# Holy Bible

## *Aionian* Edition®

### Kitaabka Quduuska Ah
### Somali Bible

AionianBible.org
Kitaabka quduuska ah ee ugu horreeya
caalamka ee aan la turjumin
Boqol kiiba boqol waa bilaash in la sawiro oona la daabaco
sidoo kale loo yaqaan
" Kitaabka Quduuska ee leh Midabka guduudka "

*Holy Bible Aionian Edition* ®
Kitaabka Quduuska Ah
Somali Bible

CC Attribution NoDerivatives NonCommercial 4.0, 2018-2024
Source text: eBible.org
Source version: 7/13/2024
Source copyright: CC Attribution NoDerivatives Noncommercial 4.0
Society for International Ministries -- Kenya (by SIM International), 1979, 2008

Formatted by Speedata Publisher 4.19.18 (Pro) on 7/19/2024
100% Free to Copy and Print
TOR Anonymously
https://AionianBible.org

Published by Nainoia Inc
https://Nainoia-Inc.signedon.net

We pray for a modern public domain translation in every language
Report content and format concerns to Nainoia Inc
Volunteer help is welcome and appreciated!

Additional Information:

The Bible in Somali published as 'Holy Bible Aionian Edition: Somali Bible'
Publication © Nainoia, Inc., Bellefonte, PA, USA, 2019
Bible Text Somali Bible in Somali © SIM International, Fort Mill, SC, USA, 2019

*Celebrate Jesus Christ's victory of grace!*

# Hordhac

Somali at AionianBible.org/Preface

The *Holy Bible Aionian Edition* ® is the world's first Bible *un-translation*! What is an *un-translation*? Bibles are translated into each of our languages from the original Hebrew, Aramaic, and Koine Greek. Occasionally, the best word translation cannot be found and these words are transliterated letter by letter. Four well known transliterations are *Christ*, *baptism*, *angel*, and *apostle*. The meaning is then preserved more accurately through context and a dictionary. The Aionian Bible un-translates and instead transliterates eleven additional Aionian Glossary words to help us better understand God's love for individuals and all mankind, and the nature of afterlife destinies.

The first three words are *aiōn*, *aiōnios*, and *aïdios*, typically translated as *eternal* and also *world* or *eon*. The Aionian Bible is named after an alternative spelling of *aiōnios*. Consider that researchers question if *aiōn* and *aiōnios* actually mean *eternal*. Translating *aiōn* as *eternal* in Matthew 28:20 makes no sense, as all agree. The Greek word for *eternal* is *aïdios*, used in Romans 1:20 about God and in Jude 6 about demon imprisonment. Yet what about *aiōnios* in John 3:16? Certainly we do not question whether salvation is eternal! However, *aiōnios* means something much more wonderful than infinite time! Ancient Greeks used *aiōn* to mean *eon* or *age*. They also used the adjective *aiōnios* to mean *entirety*, such as *complete* or even *consummate*, but never infinite time. Read Dr. Heleen Keizer and Ramelli and Konstan for proofs. So *aiōnios* is the perfect description of God's Word which has *everything* we need for life and godliness! And the *aiōnios* life promised in John 3:16 is not simply a ticket to eternal life in the future, but the invitation through faith to the *consummate* life beginning now!

The next seven words are *Sheol*, *Hadēs*, *Geenna*, *Tartaroō*, *Abyssos*, and *Limnē Pyr*. These words are often translated as *Hell*, the place of eternal punishment. However, *Hell* is ill-defined when compared with the Hebrew and Greek. For example, *Sheol* is the abode of deceased believers and unbelievers and should never be translated as *Hell*. *Hadēs* is a temporary place of punishment, Revelation 20:13-14. *Geenna* is the Valley of Hinnom, Jerusalem's refuse dump, a temporal judgment for sin. *Tartaroō* is a prison for demons, mentioned once in 2 Peter 2:4. *Abyssos* is a temporary prison for the Beast and Satan. Translators are also inconsistent because *Hell* is used by the King James Version 54 times, the New International Version 14 times, and the World English Bible zero times. Finally, *Limnē Pyr* is the Lake of Fire, yet Matthew 25:41 explains that these fires are prepared for the Devil and his angels. So there is reason to review our conclusions about the destinies of redeemed mankind and fallen angels.

The eleventh word, *eleēsē*, reveals the grand conclusion of grace in Romans 11:32. Take the time to understand these eleven words. The original translation is unaltered and a note is added to 64 Old Testament and 200 New Testament verses. To help parallel study and Strong's Concordance use, apocryphal text is removed and most variant verse numbering is mapped to the English standard. We thank our sources at eBible.org, Crosswire.org, unbound.Biola.edu, Bible4u.net, and NHEB.net. The Aionian Bible is copyrighted with creativecommons.org/licenses/by-nd/4.0, allowing 100% freedom to copy and print, if respecting source copyrights. Check the Reader's Guide and read online at AionianBible.org, with Android, and TOR network. Why purple? King Jesus' Word is royal… and purple is the color of royalty!

# History

Somali at AionianBible.org/History

04/15/85 - Aionian Bible conceived as B. and J. pray.
12/18/13 - Aionian Bible announced as J. and J. pray.
06/21/15 - Aionian Bible birthed as G. and J. pray.
01/11/16 - AionianBible.org domain registered.
06/21/16 - 30 translations available in 12 languages.
12/07/16 - Nainoia Inc established as non-profit corporation.
01/01/17 - Creative Commons Attribution No Derivatives 4.0 license added.
01/16/17 - Aionian Bible Google Play Store App published.
07/01/17 - 'The Purple Bible' nickname begins.
07/30/17 - 42 translations now available in 22 languages.
02/01/18 - Holy Bible Aionian Edition® trademark registered.
03/06/18 - Aionian Bibles available in print at Amazon.com.
10/20/18 - 70 translations now available in 33 languages.
11/17/18 - 104 translations now available in 57 languages.
03/24/19 - 135 translations now available in 67 languages.
10/28/19 - Aionian Bible nursed as J. and J. pray.
10/31/19 - 174 translations now available in 74 languages.
02/22/20 - Aionian Bibles available in print at Lulu.com.
05/25/20 - Illustrations by Gustave Doré, La Grande Bible de Tours, Felix Just.
08/29/20 - Aionian Bibles now available in ePub format.
12/01/20 - Right to left and Hindic languages now available in PDF format.
03/31/21 - 214 translations now available in 99 languages.
11/17/21 - Aionian Bible Branded Leather Bible Covers now available.
12/20/21 - Social media presence on Facebook, Twitter, LinkedIn, YouTube, etc.
01/01/22 - 216 translations now available in 99 languages.
01/09/22 - StudyPack resources for Bible translation study.
02/14/22 - Strong's Concordance from Open Scriptures and STEPBible.
02/14/23 - Aionian Bible published on the TOR Network.
12/04/23 - Eleēsē added to the Aionian Glossary.
02/04/24 - 352 translations now available in 135 languages.
05/01/24 - 371 translations now available in 151 languages.

# Jadwalka Nuxurka


**AXDIGA HORE**

Bilowgii ....11
Baxniintii .... 54
Laawiyiintii .... 91
Tirintii ....119
Sharciga Kunoqoshadiisa .... 156
Yashuuca .... 187
Xaakinnada .... 209
Ruud .... 231
Samuu'Eel Kowaad .... 234
Samuu'Eel Labaad .... 263
Boqorradii Kowaad .... 288
Boqorradii Labaad .... 317
Taariikhdii Kowaad .... 344
Taariikhdii Labaad .... 371
Cesraa .... 403
Nexemyaah .... 412
Esteer .... 425
Ayuub .... 432
Sabuurradii .... 455
Maahmaahyadii .... 508
Wacdiyahii .... 527
Gabaygii Sulaymaan .... 534
Ishacyaah .... 538
Yeremyaah .... 582
Baroorashadii Yeremyaah .... 632
Yexesqeel .... 636
Daanyeel .... 683
Hoosheeca .... 697
Yoo'Eel .... 704
Caamoos .... 707
Cobadyaah .... 713
Yoonis .... 714
Miikaah .... 716
Naxuum .... 720
Xabaquuq .... 722
Sefanyaah .... 724
Xaggay .... 726
Sekaryaah .... 728
Malaakii .... 736


**AXDIGA CUSUB**

Matayos .... 741
Markos .... 767
Luukos .... 783
Yooxanaa ....811
Falimaha Rasuullada .... 832
Rooma .... 861
1 Korintos .... 872
2 Korintos .... 883
Galatiya .... 891
Efesos .... 895
Filiboy .... 899
Kolosay .... 902
1 Tesaloniika .... 905
2 Tesaloniika .... 908
1 Timoteyos .... 910
2 Timoteyos .... 913
Tiitos .... 916
Filemon .... 918
Cibraaniyada .... 919
Yacquub .... 927
1 Butros .... 930
2 Butros .... 933
1 Yooxanaa .... 935
2 Yooxanaa .... 938
3 Yooxanaa .... 939
Yuudas .... 940
Muujintii .... 941

**KU LIFAAQAN**

Hagaha Akhrinta
Qaamuuska
Khariidadaha
Aayaha
Sawirada, Doré

AXDIGA HORE




*Kolkaasuu ninkii eryay; Beer Ceeden barigeedana wuxuu taagay Keruubiim, iyo seef ololaysa, oo dhan walba u jeesanaysa, si ay u dhawrto jidka geedka nolosha.*

Bilowgii 3:24

# Bilowgii

**1** Bilowgii Ilaah samada iyo dhulkuu abuuray. **2** Dhulkuna
qaab ma lahayn, wuuna madhnaa; gudcurna moolkuu dul
joogay; oo Ruuxa Ilaahna wuxuu ka dul dhaqdhaqaaqayay
biyaha. **3** Ilaahna wuxuu yidhi, Iftiin ha ahaado: iftiin baana
ahaaday. **4** Ilaahna wuxuu arkay iftiinkii inuu wanaagsan
yahay: Ilaahna iftiinkii ayuu ka soocay gudcurkii. **5** Ilaahna
iftiinkii wuxuu u bixiyey Maalin, gudcurkiina wuxuu u bixiyey
Habeen. Waxaana jiray fiid iyo subax, isla maalin ah. **6**
Ilaahna wuxuu yidhi, Meel bannaani ha noqoto biyaha
dhexdooda, oo iyadu biyaha ha ka soocdo biyaha. **7**
Markaasuu Ilaah sameeyey meeshii bannaanka ahayd, oo
wuxuu biyihii bannaanka ka hooseeyey ka soocay kuwii
bannaanka ka sarreeyey; sidaasayna ahaatay. **8** Ilaahna
bannaankii wuxuu u bixiyey Samo. Waxaana jiray fiid iyo
subax, maalintii labaad. **9** Ilaahna wuxuu yidhi, Biyaha
samada ka hooseeya meel ha isugu soo urureen, oo ciidda
engegani ha muuqato; sidaasayna ahaatay. **10** Markaasuu
Ilaah ciiddii engegnayd u bixiyey Dhul; ururkii biyahana
wuxuu u bixiyey Bado: oo Ilaah wuxuu arkay in taasu
wanaagsan tahay. **11** Ilaahna wuxuu yidhi, Dhulku ha soo
bixiyo doog, iyo geedo yaryar oo iniino dhala, iyo geedo
waaweyn oo midho caynkooda ah dhala, oo iniinahoodu ku
dhex jiraan, oo dhulka ku kor yaal; sidaasayna ahaatay. **12**
Dhulkiina wuxuu soo bixiyey doog, iyo geedo yaryar oo leh
iniino caynkooda ah, iyo geedo waaweyn oo midho dhala,
oo iniinahoodu ku dhex jiraan, iyagoo caynkooda ah, Ilaahna
wuxuu arkay in taasu wanaagsan tahay. **13** Waxaana jiray
fiid iyo subax, maalintii saddexaad. **14** Ilaahna wuxuu yidhi,
Iftiimmo ha ahaadeen meesha bannaan oo samada dhex
ah si ay u kala soocaan maalinta iyo habeenka; oo ha u
ahaadeen calaamooyin, iyo xilliyo, iyo maalmo iyo sannado;
**15** oo iftiimmo ha u noqdeen meeshii bannaanayd oo samada
dhex ahayd si ay u iftiimiyaan dhulka dushiisa; sidaasayna
ahaatay. **16** Oo Ilaah wuxuu sameeyey labada iftiin ee
waaweyn; si uu iftiinka weynu u xukumo maalinta, iftiinka
yaruna u xukumo habeenka; oo xiddigahana wuu sameeyey.
**17** Ilaahna wuxuu iyaga dhigay meeshii bannaanayd oo
samada dhex ahayd si ay dhulka u iftiimiyaan, **18** oo ay u
xukumaan maalinta iyo habeenka, oo ay iftiinka uga soocaan
gudcurka, Ilaahna wuxuu arkay in taasu wanaagsan tahay.
**19** Oo waxaana jiray fiid iyo subax, maalintii afraad. **20**
Oo Ilaah wuxuu yidhi, Biyuhu aad ha u soo bixiyeen uun
dhaqdhaqaaqa oo badan, oo naf nool leh, haadduna ha
duusho dhulka dushiisa xagga meeshii bannaanayd oo
samada dhex ahayd. **21** Oo Ilaah wuxuu abuuray nibiriyada
badda oo waaweyn, iyo uun kasta oo nool oo dhaqdhaqaaqa,
ee biyuhu aad u soo bixiyeen iyagoo badan, oo caynkooda
oo kale dhala, iyo haad kasta oo caynkiisa dhala; Ilaahna
wuxuu arkay in taasu wanaagsan tahay. **22** Oo Ilaah baa
barakeeyey iyaga, isagoo leh, Wax badan dhala, oo tarma,
oo biyaha badaha ka buuxsama, haadduna ha ku tarmeen
dhulka. **23** Oo waxaana jiray fiid iyo subax, maalintii shanaad.
**24** Oo Ilaah wuxuu yidhi, Dhulku ha soo bixiyo uun nool oo
caynkiisa dhala, kuwaasoo ah xoolo, iyo waxa gurguurta, iyo
dugaagga dhulka oo caynkooda dhala; sidaasayna ahaatay.
**25** Ilaahna wuxuu sameeyey dugaagga dhulka oo caynkiisa
dhala, iyo xoolo caynkooda dhala, iyo wax kasta oo dhulka
gurguurta oo caynkiisa dhala; Ilaahna wuxuu arkay in taasu
wanaagsan tahay. **26** Ilaahna wuxuu yidhi, Aan nin inoo eg
ka samayno araggeenna, oo iyagu ha xukumeen kalluunka
badda, iyo haadda hawada, iyo xoolaha, iyo dhulka oo dhan,
iyo waxa dhulka gurguurta oo dhan. **27** Oo Ilaah nin buu ka
abuuray araggiisa, Ilaah araggiisa ayuu ka abuuray isaga;
lab iyo dhaddig ayuu abuuray. **28** Oo Ilaah waa barakeeyey
iyaga; oo Ilaah wuxuu iyaga ku yidhi, Wax badan dhala oo
tarma, oo dhulka ka buuxsama, oo ka sara mara dhulka, oo
xukuma kalluunka badda, iyo haadda hawada, iyo wax kasta
oo nool oo dhulka kor dhaqdhaqaaqa. **29** Oo Ilaah wuxuu
yidhi, Bal eeg, waxaan idin siiyey geed kasta oo yar oo iniino
dhala, oo ku yaal dhulka dushiisa oo dhan, iyo geed kasta
oo weyn, kaasoo midho leh, iniinona dhala; oo waxay idiin
noqon doonaan cunto; **30** oo dugaag kasta oo dhulka jooga,
iyo haad kasta oo hawada duula, iyo wax kasta oo dhulka
gurguurta, oo naf nool leh ayaan geed kasta oo cagaar
ah cunto u siiyey; sidaasayna ahaatay. **31** Oo Ilaah wuxuu
arkay wax kasta oo uu sameeyey, oo bal eeg, aad bay u
wanaagsanaayeen. Waxaana jiray fiid iyo subax, maalintii
lixaad.

**2** Samada iyo dhulkuna way dhammaadeen, iyo waxa
badan ee ku jira oo dhammuba. **2** Maalintii toddobaadna
Ilaah wuu dhammeeyey shuqulkiisii uu sameeyey; oo
maalintii toddobaad ayuu ka nastay shuqulkiisii uu sameeyey
oo dhanba. **3** Oo Ilaah wuu barakeeyey maalintii toddobaad,
quduusna wuu ka dhigay; maxaa yeelay, maalintaas ayaa
Ilaah ka nastay shuqulkiisii uu sameeyey ee ahaa abuuridda
oo dhan. **4** Kuwanu waa bilowgii samada iyo dhulka kolkii
la abuuray iyaga, maalintii Rabbiga Ilaah ahu sameeyey
dhulka iyo samada. **5** Dhirta duurkuna weli kuma ay oollin
dhulka, geedaha yaryar oo duurkuna weli sooma ay bixin:
waayo, Rabbiga Ilaah ahu dhulka roob kuma soo dayn,
nin dhulka beeraana ma jirin; **6** laakiin ceeryaamo baa

dhulka kor uga soo bixi jirtay, oo waraabin jirtay dhulka
dushiisa oo dhan. 7 Rabbiga Ilaah ahuna nin buu ka
sameeyey ciidda dhulka, dulalka sankiisana wuxuu kaga
afuufay neeftii nolosha; ninkiina wuxuu noqday naf nool. 8
Oo Rabbiga Ilaah ahu beer buu ka beeray xagga bari ee
Ceeden; oo halkaasuuna geeyey ninkii uu sameeyey. 9
Rabbiga Ilaah ahuna wuxuu dhulka ka soo bixiyey geed
kasta oo indhaha u roon, oo cunto ku wanaagsan; beerta
dhexdeedana wuxuu ka soo bixiyey geedkii nolosha iyo
geedkii aqoonta wanaagga iyo xumaanta. 10 Ceedenna
webi baa ka baxay inuu beerta waraabiyo; halkaasuuna
ku kala qaybsamay, wuxuuna noqday afar madax. 11 Kan
kowaad magiciisu wuxuu ahaa Fiishoon: kaasu waa kan ku
wareegsan dhulka Xawiilaah oo dhan, meeshaas oo dahab
leh; 12 oo dahabka dhulkaasu waa wanaagsan yahay: oo
meeshaasuna waxay leedahay beduliyum iyo dhagaxyo
onika la yidhaahdo. 13 Webiga labaad magiciisuna waa
Giixoon: kaasuna waa kan ku wareegsan dhulka Kuush oo
dhan. 14 Webiga saddexaad magiciisuna waa Xiddeqel:
kaasu waa kan Ashuur dhankeeda bari mara. Webiga
afraadna waa Yufraad. 15 Rabbiga Ilaah ahuna ninkii wuu
kaxeeyey oo wuxuu geeyey beer Ceeden inuu falo oo
dhawro. 16 Rabbiga Ilaah ahuna wuxuu ninkii ku amray
isagoo leh, Geed kasta oo beerta ku yaal wax baad ka cuni
kartaa: 17 laakiin geedka aqoonta wanaagga iyo xumaanta
waa inaanad waxba ka cunin: waayo, maalintii aad wax ka
cuntid hubaal waad dhiman doontaa. 18 Oo Rabbiga Ilaah
ahu wuxuu yidhi, Ma wanaagsana in ninku keligiis ahaado;
waxaan u samayn doonaa mid caawisa oo ku habboon. 19
Rabbiga Ilaah ahuna wuxuu ciidda ka sameeyey dugaag
kasta oo duurka jooga, iyo haad kasta oo hawada duula; oo
iyagii wuxuu u keenay ninkii, inuu arko wuxuu u bixiyo; oo
wax kastoo ninkii u bixiyey uun kasta oo nool ayaa magiciisii
noqday. 20 Oo ninkii baa magacyo u bixiyey xoolaha oo
dhan, iyo haadda hawada, iyo dugaag kasta oo duurka
jooga, laakiin ninkii looma helin mid caawisa oo ku habboon.
21 Oo Rabbiga Ilaah ahu hurdo weyn buu ku riday ninkii,
kolkaasuu gam'ay; kolkaasuu wuxuu ka bixiyey feedhihiisii
middood, meesheediina hilib buu ku awday. 22 Oo feedhii
Rabbiga Ilaah ahu ka bixiyey ninka ayuu naag ka sameeyey,
oo wuxuu iyadii u keenay ninkii. 23 Ninkiina wuxuu yidhi,
Tanu hadda waa laf ka mid ah lafahayga, iyo hilib ka mid
ah hilibkayga: waxaa iyada loogu yeedhi doonaa Naag,
maxaa yeelay, iyada waxaa laga soo saaray Nin. 24 Sidaas
daraaddeed nin wuxuu ka tegayaa aabbihiis iyo hooyadiis,
wuxuuna la joogayaa naagtiisa: oo waxay noqonayaan isku
jidh. 25 Oo labadooduba way qaawanaayeen, ninka iyo
naagtiisuba, mana ay xishoonaynin.

3 Haddaba abeesadu way ugu khiyaano badnayd bahal
kasta ee duurka jooga oo Rabbiga Ilaah ahu sameeyey.
Oo waxay naagtii ku tidhi, Ilaah miyuu idinku yidhi, Waa
inaydnaan waxba ka cunin geed kasta oo beerta ku yaal? 2
Naagtiina waxay abeesadii ku tidhi, Midhaha geedaha beerta
waannu cuni karnaa; 3 laakiinse midhaha geedka beerta
dhexdeeda ku yaal, Ilaah wuxuu nagu yidhi, Waa inaydnaan
waxba ka cunin, ama aydnaan taaban, yeydnan dhimanine.
4 Abeesadiina waxay naagtii ku tidhi, Ma dhiman doontaan;
5 waayo, Ilaah wuxuu og yahay in maalinta aad cuntaan ay
indhihiinnu furmi doonaan, oo aad noqon doontaan sida Ilaah
oo kale, idinkoo kala garanaya wanaagga iyo xumaanta. 6
Oo markii naagtii aragtay in geedkii cunto ku wanaagsan
yahay, oo indhaha u roon yahay, oo uu yahay geed caqli
lagu yeesho, ayay midho ka qaadatay, oo cuntay; ninkeedii
la joogayna wax bay ka siisay, oo isagiina wuu cunay. 7 Oo
labadoodiiba indhahoodii way furmeen, oo waxay garteen
inay qaawan yihiin; waxayna isku tosheen caleemo berde,
oo ay gunti ka samaysteen. 8 Oo waxay maqleen codkii
Rabbiga Ilaaha ah, isagoo beerta dhex socda kolkii maalintu
qaboobayd: oo ninkii iyo naagtiisii way iska qariyeen Ilaah,
oo waxay ku dhuunteen geedihii beerta dhexdooda. 9
Oo Rabbiga Ilaah ahu wuu u yeedhay ninkii, oo wuxuu
ku yidhi, Xaggee baad joogtaa? 10 Isagiina wuxuu yidhi,
Codkaagaan beerta ka dhex maqlay, waanan cabsaday,
maxaa yeelay, waan qaawanaa; oo waan isqariyey. 11
Kolkaasuu ku yidhi, Yaa kuu sheegay inaad qaawan tahay?
Miyaad wax ka cuntay geedkii aan kugu amray inaadan
wax ka cunin? 12 Ninkiina wuxuu yidhi, Naagtii aad i siisay
inay ila joogto ayaa geedkii wax iga siisay, oo anna waan
cunay. 13 Oo Rabbiga Ilaah ahu wuxuu naagtii ku yidhi,
Waa maxay waxan aad samaysay? Naagtiina waxay tidhi,
Abeesadaa i khiyaanaysay oo anna waan cunay. 14 Oo
Rabbiga Ilaah ahu wuxuu abeesadii ku yidhi, Waxan aad
samaysay aawadiis waad ka habaaran tahay xoolaha oo
dhan, iyo dugaag kasta oo duurka jooga; waxaanad ku socon
doontaa boggaaga, ciid baanad cuni doontaa maalmaha
cimrigaaga oo dhan: 15 oo colaad baan idin dhex dhigi
doonaa adiga iyo naagta, iyo farcankaaga iyo farcankeeda;
oo madaxaaguu burburin doonaa, adiguna cedhibtiisaad
burburin doontaa. 16 Naagtiina wuxuu ku yidhi, Dhibtaada
iyo wallacaaga aad baan u badin doonaa; oo dhib baad
carruur ku dhali doontaa; oo waxay doonistaadu ahaan
doontaa ninkaaga, wuuna kuu talin doonaa. 17 Aadanna

wuxuu ku yidhi, Codkii naagtaadaad maqashay oo waxaad
wax ka cuntay geedkii aan kugu amray, anigoo leh, Waa
inaadan waxba ka cunin, sidaas daraaddeed dhulku waa
habaaran yahay adiga aawadaa; maalmaha cimrigaaga oo
dhanna dhibaataad wax kaga cuni doontaa. 18 Qodxan iyo
yamaarugna waa kaaga soo bixi doonaan, waxaanad cuni
doontaa geedaha yaryar oo duurka. 19 Wejigaagoo dhididsan
baad wax cuni doontaa, ilaa aad dhulka ku noqotid; maxaa
yeelay, dhulkaa lagaa qaaday; waayo, ciid baad tahay, ciid
baadna ku noqon doontaa. 20 Ninkiina wuxuu naagtiisii
u bixiyey Xaawa, maxaa yeelay, waxay ahayd hooyadii
waxa nool oo dhan. 21 Rabbiga Ilaah ahuna wuxuu Aadan
iyo naagtiisii u sameeyey dhar harag ah, wuuna u xidhay
iyagii. 22 Oo Rabbiga Ilaah ahuna wuxuu yidhi, Ninku wuxuu
noqday sidii mid innaga mid ah, isagoo garanaya wanaagga
iyo xumaanta; oo haatan, waaba intaasoo uu gacantiisa soo
fidiyaa, oo uu wax ka qaataa geedka nolosha, oo uu cunaa
oo uu weligiis noolaadaa: 23 sidaas daraaddeed Ilaah isaga
wuu ka saaray Beer Ceeden, si uu u beerto dhulkii isaga
laga soo qaaday. 24 Kolkaasuu ninkii eryay; Beer Ceeden
barigeedana wuxuu taagay Keruubiim, iyo seef ololaysa,
oo dhan walba u jeesanaysa, si ay u dhawrto jidka geedka
nolosha.

**4** Ninkiina naagtiisii Xaawa ahayd buu u tegey; wayna
uuraysatay, oo Qaabiil bay dhashay, oo waxay tidhi, Wiil
baan ku helay Rabbiga caawimaaddiisa. 2 Dabadeedna
waxay dhashay walaalkiis Haabiil. Haabiilna wuxuu ahaa
adhijir, laakiin Qaabiil wuxuu ahaa beerfale. 3 Maalmo
dabadeed waxay noqotay in Qaabiil qurbaan ahaan Rabbiga
ugu keenay midhihii dhulka. 4 Haabiilna wuxuu wax uga
keenay curadyadii adhigiisa iyo baruurtoodiiba. Rabbiguna
wuu eegay Haabiil iyo qurbaankiisii; 5 laakiinse Qaabiil iyo
qurbaankiisii Rabbigu ma uu eegin. Qaabiilna aad buu u
cadhooday, wejigiisiina wuu madoobaaday. 6 Oo Rabbigu
wuxuu ku yidhi Qaabiil, Maxaad u cadhoonaysaa? Maxaase
wejigaagu u madoobaaday? 7 Haddaad wax wanaagsan
samaysid, sow laguma aqbaleen? Haddaadan wax
wanaagsan samaynse, dembi illinkuu kuugu gabbanayaa;
doonistiisuna aday noqon doontaa, adiguna waa inaad
xukuntid isaga. 8 Qaabiilna wuxuu ku yidhi walaalkiis
Haabiil, Ina keen, aynu duurka tagnee. Waxaana dhacday,
markii ay duurka joogeen, in Qaabiil walaalkiis Haabiil ku
kacay oo dilay isagii. 9 Rabbiguna wuxuu Qaabiil ku yidhi,
Walaalkaa Haabiil meeh? Kolkaasuu yidhi, Ma aqaan: ma
anigaa ah walaalkay ilaaliyihiisa? 10 Kolkaasaa Ilaah ku
yidhi, Maxaad samaysay? Codkii dhiiggii walaalkaa ayaa
dhulka iiga dhawaaqayaye. 11 Oo haatan waad ka habaaran
tahay dhulkii afkiisa u kala qaaday si uu dhiiggii walaalkaa
gacantaada uga helo. 12 Kolkii aad dhulka beeratid, wax
badan kuuma dhali doono. Waxaad dhulka ku noqon doontaa
mid carcarara oo warwareega. 13 Qaabiilna wuxuu Rabbiga
ku yidhi, Taqsiirtaydu waa ka sii badan tahay wax aan qaadi
karo. 14 Bal eeg, maanta dhulkaad iga eriday, wejigaagana
waan ka qarsoonaan doonaa, waxaanan dhulka ku noqon
doonaa mid carcarara oo warwareega; waxaana dhici doonta
in kii i arkaaba i dili doono. 15 Oo Rabbigu wuxuu ku yidhi
isagii, Sidaas daraaddeed ku alla kii dila Qaabiil, waxaa
looga aargudan doonaa toddoba labanlaab. Rabbiguna
calaamad buu u sameeyey Qaabiil, si aanu ku alla kii
arkaaba u dilin. 16 Qaabiilna Rabbiga hortiisuu ka tegey,
oo wuxuu degay dalkii la odhan jiray Nood, oo xagga bari
oo Ceeden ku yiil. 17 Qaabiilna naagtiisuu u tegey; wayna
uuraysatay, oo waxay dhashay Enoog. Wuxuuna dhisay
magaalo, oo magaaladiina wuxuu ku magacaabay magicii
wiilkiisii Enoog. 18 Enoogna waxaa u dhashay Ciiraad,
Ciiraadna wuxuu dhalay Mexuuya'el, Mexuuya'elna wuxuu
dhalay Metuusha'el, Metuusha'elna wuxuu dhalay Lameg. 19
Lamegna wuxuu guursaday laba naagood; mid magaceedu
wuxuu ahaa Caadah, tan kalena magaceedu wuxuu ahaa
Sillah. 20 Caadahna waxay dhashay Yaabaal: isna wuxuu
ahaa aabbihii kuwa teendhooyinka deggan oo xoolaha leh.
21 Magaca walaalkiisna wuxuu ahaa Yuubaal; isna wuxuu
ahaa aabbihii kuwa kataaradda iyo biibiilaha garaaca. 22
Sillahna waxay dhashay Tuubalqayin oo ahaa mid tumi
jiray alaabtii naxaasta iyo birta ahayd oo dhan; Tuubalqayin
walaashiisna waxay ahayd Nacmah. 23 Lamegna wuxuu
naagihiisii ku yidhi: Caadah iyo Sillahay, codkayga maqla;
Lameg naagihiisow, hadalkayga dhegaysta; Nin baan u dilay
dhaawicid uu i dhaawacay aawadeed, Iyo nin dhallinyar
dhufashadii uu wax igu dhuftay aawadeed. 24 Haddii Qaabiil
toddoba labanlaab looga aargudan lahaa, Runtii Lameg
waa in toddoba iyo toddobaatan labanlaab looga aar gutaa.
25 Aadanna naagtiisii mar kale ayuu u tegey; waxayna
dhashay wiil, magiciisiina waxay u bixisay Seed, iyadoo leh,
Ilaah abuur kaluu ii soo dhigay Haabiil meeshiisii; waayo,
Qaabiil baa dilay isagii. 26 Seedna waxaa u dhashay wiil,
magiciisiina wuxuu u bixiyey Enoos; markaasaa dadkii waxay
bilaabeen inay Rabbiga ku baryaan magiciisa.

**5** Kanu waa buuggii farcankii Aadan. Maalintii Ilaah ninkii
abuuray, ekaanta Ilaah buu ka sameeyey isagii; 2 wuxuu
abuuray iyagoo lab iyo dhaddig ah; wuuna barakeeyey
iyagii, magacoodiina wuxuu u bixiyey Aadan maalintii iyagii
la abuuray. 3 Aadanna wuxuu jiray boqol iyo soddon

sannadood, wuxuuna dhalay wiil isagii u eg oo araggiisii leh;
magiciisiina wuxuu u bixiyey Seed. 4 Aadanna markuu Seed
dhalay ka dib wuxuu noolaa siddeed boqol oo sannadood;
wiilal iyo gabdhona wuu dhalay. 5 Wakhtigii Aadan noolaa oo
dhammuna wuxuu ahaa sagaal boqol iyo soddon sannadood;
dabadeedna wuu dhintay. 6 Seedna wuxuu jiray boqol
iyo shan sannadood, wuxuuna dhalay Enoos. 7 Seedna
markuu Enoos dhalay ka dib wuxuu noolaa siddeed boqol
iyo toddoba sannadood, wiilal iyo gabdhona wuu dhalay. 8
Wakhtigii Seed noolaa oo dhammuna wuxuu ahaa sagaal
boqol iyo laba iyo toban sannadood; dabadeedna wuu
dhintay. 9 Enoosna wuxuu jiray sagaashan sannadood,
wuxuuna dhalay Qaynaan. 10 Enoosna markuu Qaynaan
dhalay ka dib wuxuu noolaa siddeed boqol iyo shan iyo toban
sannadood, wiilal iyo gabdhona wuu dhalay. 11 Wakhtigii
Enoos noolaa oo dhammuna wuxuu ahaa sagaal boqol iyo
shan sannadood; dabadeedna wuu dhintay. 12 Qaynaanna
wuxuu jiray toddobaatan sannadood, wuxuuna dhalay
Mahalale'el. 13 Qaynaanna markuu Mahalale'el dhalay ka
dib wuxuu noolaa siddeed boqol iyo afartan sannadood,
wiilal iyo gabdhona wuu dhalay. 14 Wakhtigii Qaynaan
noolaa oo dhammuna wuxuu ahaa sagaal boqol iyo toban
sannadood, dabadeedna wuu dhintay. 15 Mahalale'elna
wuxuu jiray shan iyo lixdan sannadood, wuxuuna dhalay
Yaared. 16 Mahalale'elna markuu Yaared dhalay ka dib
wuxuu noolaa siddeed boqol iyo soddon sannadood, wiilal
iyo gabdhona wuu dhalay. 17 Wakhtigii Mahalale'el noolaa
oo dhammuna wuxuu ahaa siddeed boqol iyo shan iyo
sagaashan sannadood, dabadeedna wuu dhintay. 18
Yaaredna wuxuu jiray boqol iyo laba iyo lixdan sannadood,
wuxuuna dhalay Enoog. 19 Yaaredna markuu Enoog dhalay
ka dib wuxuu noolaa siddeed boqol oo sannadood, wiilal
iyo gabdhona wuu dhalay. 20 Wakhtigii Yaared noolaa oo
dhammuna wuxuu ahaa sagaal boqol iyo laba iyo lixdan
sannadood; wuuna dhintay. 21 Enoogna wuxuu jiray shan
iyo lixdan sannadood, wuxuuna dhalay Metushelax. 22
Enoogna wuxuu la socday Ilaah saddex boqol oo sannadood
markuu Metushelax dhalay ka dib, wiilal iyo gabdhona wuu
dhalay. 23 Wakhtigii Enoog jiray oo dhammuna wuxuu ahaa
saddex boqol iyo shan iyo lixdan sannadood. 24 Enoogna
Ilaah buu la socday; waana la waayay; maxaa yeelay, Ilaah
baa qaatay isagii. 25 Metushelaxna wuxuu jiray boqol iyo
toddoba iyo siddeetan sannadood, wuxuuna dhalay Lameg.
26 Metushelaxna wuxuu noolaa markuu Lameg dhalay ka dib
toddoba boqol iyo laba iyo siddeetan sannadood, wiilal iyo
gabdhona wuu dhalay. 27 Wakhtigii Metushelax noolaa oo
dhammuna wuxuu ahaa sagaal boqol iyo sagaal iyo lixdan
sannadood; dabadeedna wuu dhintay. 28 Lamegna wuxuu
jiray boqol iyo laba iyo siddeetan sannadood; wuxuuna
dhalay wiil: 29 magiciisiina wuxuu u bixiyey Nuux, isagoo leh,
Kanu waa inooga raaxayn doonaa shuqulkeenna iyo hawsha
gacmaheenna, xagga dhulka Ilaah habaaray. 30 Lamegna
markuu Nuux dhalay ka dib wuxuu noolaa shan boqol iyo
shan iyo sagaashan sannadood, wiilal iyo gabdhona wuu
dhalay. 31 Wakhtigii Lameg noolaa oo dhammuna wuxuu
ahaa toddoba boqol iyo toddoba iyo toddobaatan sannadood;
dabadeedna wuu dhintay. 32 Nuuxna wuxuu jiray shan
boqol oo sannadood; wuxuuna dhalay Sheem, iyo Xaam, iyo
Yaafed.

**6** Waxayna noqotay, markii ay bilaabatay in dadku ku
bataan dhulka oo ay gabdho u dhashaan, 2 in wiilashii
Ilaah arkeen gabdhihii dadku inay wanaagsan yihiin, oo ay
guursadeen in alla intay doorteen oo dhan. 3 Rabbiguna
wuxuu yidhi, Ruuxaygu lama sii dagaallami doono dadka
weligiis, maxaa yeelay, isagu waa jidh, laakiinse cimrigiisu
wuxuu noqon doonaa boqol iyo labaatan sannadood. 4
Waagaas waxaa dhulka joogay dad waaweyn oo xoog
badan, taas ka dibna kolkii wiilashii Ilaah u yimaadeen
gabdhihii dadka, oo ay carruur u dhaleen, isla kuwaas waxay
ahaayeen nimankii xoogga badnaa oo waagii hore ahaa
raggii caanka ahaa. 5 Rabbiguna wuxuu arkay in dadka
sharkiisu ku badan yahay dhulka, iyo in male kasta oo
fikirrada qalbigiisu ay shar keliya yihiin had iyo goorba. 6
Rabbiguna wuxuu ka qoomamooday abuuriddii uu dadka
ku abuuray dhulka, wuuna caloolxumaaday. 7 Oo Rabbigu
wuxuu yidhi, Waxaan dhulka ka baabbi'in doonaa dadkii aan
abuuray; dadka, iyo weliba dugaagga, iyo waxa gurguurta,
iyo haadda hawada; maxaa yeelay, waan ka qoomamooday
samayntii aan sameeyey iyaga. 8 Laakiin Rabbigu Nuux
raalli buu ka ahaa. 9 Kuwanu waa farcankii Nuux. Nuux
wuxuu ahaa nin xaq ah, oo ku eed la' farcankiisii; Nuuxna
Ilaah buu la socon jiray. 10 Oo Nuux wuxuu dhalay saddex
wiil oo ahaa Sheem, iyo Xaam iyo Yaafed. 11 Dhulkuna
wuu kharribnaa Ilaah hortiisa, dhulkana dulmi baa ka
buuxsamay. 12 Ilaahna wuxuu arkay dhulka, oo bal eeg, wuu
kharribnaa; waayo, intii jidh lahayd oo dhammu jidkooday ku
kharribeen dhulka. 13 Oo Ilaah wuxuu Nuux ku yidhi, Intii
jidh leh oo dhan dhammaadkoodii aan dhammayn lahaa
ayaa gaadhay; waayo, dhulkii waxaa ka buuxsamay dulmi
iyaga ka yimid, oo bal eeg, iyagaan dhulka la baabbi'in
doonaa. 14 Doonni ka samayso qoryo gofer ah; qowladana
ka dhex samee doonnida, daamurna ka mari dusha iyo
hoostaba. 15 Waa inaad sidatan u samaysid iyada: doonnida

dhererkeeda waxaad ka dhigtaa saddex boqol oo dhudhun,
ballaadhkeedana waxaad ka dhigtaa konton dhudhun,
sarajooggeedana waxaad ka dhigtaa soddon dhudhun. 16
Waa inaad dariishadna u samaysid doonnida, oo waxaad ku
dhammaysaa in dhudhun ah ilaa xaggeeda sare, albaabka
doonnidana dhinaca ka samee, dabaqad hoose, iyo tu
labaad, iyo tu saddexaadna u samee iyada. 17 Oo bal
eeg, anigu daad biyo ah baan ku soo dayn dhulka, inaan
baabbi'iyo inta jidhka leh oo dhan oo neefta noloshu ku jirto,
inta samada ka hoosaysa; wax kasta oo dhulka joogaaba
way dhiman doonaan. 18 Laakiin axdigayga adigaan kula
dhigan doonaa; oo doonnidaad soo geli doontaan, adiga,
iyo wiilashaada, iyo naagtaada, iyo naagaha wiilashaada
ee kula jiraba. 19 Oo wax kasta oo nool oo jidh leh waa
inaad cayn walba laba ka soo gelisaa doonnida, si ay kuula
sii noolaadaan; waana inay ahaadaan lab iyo dhaddig. 20
Haadda caynkooda, iyo xoolaha caynkooda, iyo wax kasta
oo dhulka gurguurta caynkooda, cayn walba laba ka mid ihi
ha kuu soo galeen, si ay u sii noolaadaan. 21 Cuntada la
cuno oo dhanna qaado, oo kulligeed ururso oo waxay idiin
noqon doontaa cunto, adiga iyo iyagaba. 22 Sidaasuu Nuux
sameeyey; wax kasta sidii Ilaah ugu amray buu u sameeyey.

**7** Oo Rabbigu wuxuu Nuux ku yidhi, Adiga iyo dadka
gurigaaguba soo gala doonnida; waayo, waxaan arkay
adigoo qarnigan xaq ku ah hortayda. 2 Xoolaha daahirka
ah toddoba iyo toddoba ka qaad, ku lab iyo dhaddiggiis;
xoolaha aan daahirka ahaynna laba ka qaad, ku lab iyo
dhaddiggiis; 3 haadda hawadana toddoba iyo toddoba ka
qaad, lab iyo dhaddig: si farcan ugu sii noolaado dhulka
dushiisa oo dhan. 4 Waayo, waxaa weli hadhay toddoba
maalmood, dabadeedna afartan maalmood iyo afartan
habeen ayaan roob ku soo dayn dhulka; oo wax kasta oo
nool oo aan sameeyey waan ka baabbi'in doonaa dhulka
dushiisa. 5 Nuuxna wax kasta sidii Rabbigu ugu amray ayuu
u sameeyey. 6 Nuuxna wuxuu jiray lix boqol oo sannadood
markii daadka biyuhu dhulka dul joogay. 7 Nuuxna doonniduu
galay, isagii iyo wiilashiisii iyo naagtiisii, iyo naagihii wiilashiisii
ee la jiray oo dhan, waxayna ka soo galeen biyihii daadka.
8 Xoolihii daahirka ahaa, iyo xoolihii aan daahirka ahayn,
iyo haaddii iyo wax kasta oo dhulka gurguurtaba 9 Nuux
bay laba laba ugu galeen doonnidii, lab iyo dhaddig, sidii
Ilaah ugu amray Nuux. 10 Waxaana dhacday, in toddobadii
maalmood dabadeed, ay biyihii daadka ahaa dhulka dul
joogeen. 11 Sannaddii uu Nuux lix boqol oo sannadood jiray,
bisheedii labaad, maalintii toddoba iyo tobnaad oo bisha,
isla maalintaas ayaa ilihii moolka weyn biyo ka buqdeen,
dariishadihii samadana la furay. 12 Roobkuna wuxuu dhulka
ku da'ayay afartan maalmood iyo afartan habeen. 13 Isla
maalintaas Nuux wuxuu galay doonnidii, isagii iyo Sheem, iyo
Xaam, iyo Yaafed, oo ahaa wiilashii Nuux, iyo naagtii Nuux,
iyo saddexdii naagood oo wiilashiisa ee la jiray; 14 iyagii,
iyo dugaag kasta caynkiisa, iyo xoolo kasta caynkooda, iyo
wax kasta oo dhulka gurguurta caynkooda, iyo haad kasta
caynkiisa, iyo shimbir kasta oo cayn kasta ah. 15 Wax kasta
oo jidh leh oo neefta noloshu ku jirtaba Nuux bay laba laba
ugu galeen doonnidii. 16 Oo kuwii galay waxay ahaayeen
lab iyo dhaddig oo wax kasta oo jidh leh, sidii Ilaah ku amray
isagii: oo Ilaahna waa ku xidhay isagii. 17 Daadkiina afartan
maalmood buu dhulka dul joogay; biyihiina way sii kordheen,
oo doonnidii bay kor u qaadeen, oo waxaa iyadii kor looga
qaaday dhulka. 18 Biyihiina way xoogaysteen, oo dhulkay
aad ugu kordheen; doonnidiina waxay dul socotay biyihii. 19
Biyihiina aad bay ugu xoogaysteen dhulka; oo dhammaan
buurihii dhaadheeraa oo samada oo dhan ka hooseeyey way
qarsoomeen. 20 Shan iyo toban dhudhun baa biyihii xagga
sare xoog ugu kaceen; buurihiina way qarsoomeen. 21 Oo
wax kasta oo jidh leh oo dhulka ku dul dhaqaaqaaba way
dhinteen, haaddii, iyo xoolihii, iyo dugaaggii, iyo wax kasta
oo dhulka gurguurta, iyo dadkii oo dhanba. 22 Wax walba
oo dhulka engegan joogay oo dulalka sankiisa ay neefta
ruuxa nolosha ku jirtay, way wada dhinteen. 23 Waxaa la
wada baabbi'iyey wixii dhulka dushiisa ku noolaa oo dhan,
xataa dadkii, iyo xoolihii, iyo wixii gurguuran jiray, iyo haaddii
cirka; kulli waa laga wada baabbi'iyey dhulka; oo waxaa
hadhay Nuux oo keliya, iyo kuwii doonnidii kula jiray isagii.
24 Biyihiina boqol iyo konton maalmood ayay dhulka xoog ku
lahaayeen.

**8** Oo Ilaah wuxuu xusuustay Nuux, iyo wixii noolaa, iyo
xoolihii doonnidii kula jiray isagii oo dhan; oo Ilaah dabayl
buu dhulka dul mariyey, biyihiina way dhinmeen; 2 ilihii
moolka iyo dariishadihii samaduna way awdmeen; roobkii
samadana waa la joojiyey; 3 biyihiina had iyo goorba dhulkay
ka noqonayeen, oo boqol iyo konton maalmood dabadood
ayaa biyihii dhinmeen. 4 Oo bishii toddobaad, maalinteedii
toddoba iyo tobnaad, ayay doonnidii ku fadhiisatay buuraha
Araarad. 5 Biyihiina way sii dhinmayeen ilaa bishii tobnaad.
Bishii tobnaad, maalinteedii kowaad, ayaa buuraha dushoodii
la arkay. 6 Waxaana dhacday in afartan maalmood dabadood
Nuux furay dariishaddii doonnidii uu sameeyey; 7 oo wuxuu
dibadda u diray tuke, hor iyo dib buuna u duulayay, ilaa
intay biyihii ka engegeen dhulka dushiisa. 8 Dabadeedna
wuxuu diray qoolley si uu u ogaado bal in biyihii dhulka

dushiisa ka yaraadeen iyo in kale; 9 laakiin qoolleydii meel
ay cagta dhigto ayay weyday, kolkaasay Nuux xaggiisii ku
soo noqotay iyo xaggii doonnidii, maxaa yeelay, biyihii baa
dhulka oo dhan dul joogay; kolkaasuu gacanta dibadda u
bixiyey, oo soo qabtay iyadii, oo soo geliyey doonnidii. 10
Kolkaasuu toddoba maalmood oo kale sugay; markaasuu
mar kale qoolleydii doonnidii ka diray; 11 qoolleydiina waxay
isagii ku soo noqotay fiidkii; oo afkana waxay ku wadatay
caleen saytuun oo qoyan; kolkaasuu Nuux ogaaday in biyihii
dhulka ka yaraadeen. 12 Kolkaasuu toddoba maalmood
oo kale sugay; dabadeedna qoolleydii buu diray; iyadiina
mar dambe kuma ay soo noqon. 13 Oo waxaana dhacday
sannaddii lix boqol iyo kowaad, bishii kowaad, maalinteedii
kowaad, inay biyihii dhulka ka engegeen: Nuuxna daboolkii
buu doonnidii ka qaaday, wuuna fiiriyey, oo bal eeg, dhulka
dushiisu way engegnayd. 14 Oo bishii labaad, maalinteedii
toddoba iyo labaatanaad, ayaa dhulka engegay. 15 Ilaahna
Nuux buu la hadlay, isagoo leh, 16 Doonnida ka baxa adiga,
iyo naagtaada, iyo wiilashaada, iyo naagaha wiilashaada ee
kula jiraba. 17 Soo bixi wax kasta oo nool oo kula jooga, inta
jidhka leh oo dhan, kuwaas oo ah haadda, iyo xoolaha, iyo
waxa dhulka gurguurta oo dhan; si ay dhulka ugu bataan, oo
ay wax badan u dhalaan, oo ay dhulka ugu tarmaan. 18
Nuuxna wuu baxay, isagii iyo wiilashiisii, iyo naagtiisii, iyo
naagihii wiilashiisa ee la jirayba. 19 Dugaag kasta, iyo wax
kasta oo gurguurta, iyo haad kasta, iyo wax alla wixii dhulka
ku dhaqaaqaaba, jinsigoodii ayay doonnidii kala soo baxeen.
20 Nuuxna meel allabari buu Rabbiga u dhisay; xayawaankii
daahirka ahaa iyo haaddii daahirka ahaydba, intuu wax ka
qaatay, ayuu allabaryo la gubo ku bixiyey meeshii allabariga
dusheeda. 21 Rabbiguna wuxuu uriyey caraftii udgoonayd,
kolkaasuu Rabbigu iska yidhi qalbigiisa, Mar dambe dadka
aawadiis dhulka uma habaari doono, maxaa yeelay, malaha
qalbiga dadku waa shar tan iyo yaraantiisa; mar dambena
ma aan dili doono wax kasta oo nool sidii aan yeelay. 22
Intuu dhulku jiro, beer abuurid, iyo beer goosasho, iyo qabow
iyo kulayl, iyo gu iyo jiilaal, iyo habeen iyo maalin midnaba
ma joogsan doono.

9 Oo Ilaah waa barakeeyey Nuux iyo wiilashiisii, oo wuxuu
ku yidhi, Wax badan dhala, oo tarma, oo dhulka ka
buuxsama. 2 Cabsidiinna iyo baqdintiinnu way la jiri doonaan
dugaag kasta, iyo haad kasta oo hawada, iyo waxa dhulka
gurguurta oo dhan, iyo kalluunka badda oo dhan, gacmihiinna
baa laydiin geliyey iyaga. 3 Wax kasta oo dhaqdhaqaaqa
oo noolu cuntay idiin noqon doonaan; sidii aan geedaha
cagaarka ah idiin siiyey ayaan kulli idiin siiyey. 4 Laakiin
waa inaydnaan cunin hilibka noloshiisu la jirto, taasoo ah
dhiiggiisa. 5 Oo hubaal dhiigga naftiinna waan weyddiin, oo
waxaan weyddiin dugaag kasta iyo dadkaba, xataa nafta nin
kasta walaalkiis waan weyddiin. 6 Ku kasta oo nin dhiiggiis
daadiya, nin baa isna dhiiggiisa daadin doona: waayo, Ilaah
araggiisuu ka sameeyey ninka. 7 Idinku wax badan dhala,
oo tarma; aad iyo aadna ugu farcama dhulka, kuna tarma
dhexdiisa. 8 Oo Ilaah Nuux buu la hadlay, iyo wiilashiisii la
joogay, isagoo ku leh, 9 Bal eega, anigu axdigayga baan
idinku adkaynayaa, idinka iyo farcankiinna idinka dambeeya;
10 iyo uun kasta oo nool oo idinla jooga, haadda iyo xoolaha,
iyo dugaag kasta oo dhulka idinla jooga; oo ah in alla intii
ka soo baxda doonnida, xataa dugaag kasta oo dhulka.
11 Oo waxaan idinku adkayn doonaa axdigayga; inta jidh
leh oo dhan mar dambe biyo daad ah laguma baabbi'in
doono; daad dambe oo dhulka baabbi'iyaana mar dambe
ma jiri doono. 12 Oo Ilaah wuxuu yidhi, Waa tan calaamadii
axdiga aan idinla dhiganayo idinka iyo uun kasta oo nool oo
idinla jooga, tan iyo qarni kasta. 13 Waxaan qaansadayda ku
dhex dhigay daruurta, waxayna noqon doontaa calaamadii
axdiga dhex yaal aniga iyo dhulka. 14 Waxaana dhici doonta,
markii aan dhulka daruur dul keeno, in qaansada lagu
arki doono daruurta dhexdeeda, 15 oo waxaan xusuusan
doonaa axdigayga ina dhex yaal aniga iyo idinka iyo uun
kasta oo nool oo jidh kasta leh; biyuhuna dib dambe ma
noqon doonaan daad baabbi'iya inta jidh leh oo dhan. 16
Qaansaduna waxay ku dhex jiri doontaa daruurta; anna
waan fiirin doonaa iyada, inaan xusuusto axdiga weligiis
dhex yaal Ilaah iyo uun kasta oo nool oo jidh kasta leh oo
dhulka jooga. 17 Oo Ilaah wuxuu Nuux ku yidhi, Tanu waa
calaamadii axdigii aan ku adkeeyey inta jidhka leh oo dhulka
joogta. 18 Oo wiilashii Nuux oo doonnidii ka soo baxay,
waxay ahaayeen Sheem, iyo Xaam, iyo Yaafed: Xaamna waa
Kancaan aabbihiis. 19 Saddexdanu waxay ahaayeen wiilashii
Nuux; oo iyagii farcankoodii baa dhulka oo dhan ku fiday.
20 Nuuxna wuxuu bilaabay inuu beerrey noqdo, oo wuxuu
beertay canab. 21 Kolkaasuu wax ka cabbay khamrigeedii,
wuuna sakhraamay; oo teendhadiisii dhexdeeda ayuu ku
qaawanaa. 22 Oo Xaam, oo ahaa Kancaan aabbihiis, ayaa
arkay qaawanaantii aabbihiis, kolkaasuu u sheegay labadii
walaalihiis ahayd oo dibadda joogta. 23 Kolkaasaa Sheem
iyo Yaafed dhar qaadeen, oo labadoodu garbahay saareen,
oo dib dib u socdeen, kolkaasay qaawanaantii aabbahood ku
dedeen, oo wejiyadooduna way sii jeedeen, mana ay arkin
qaawanaantii aabbahood. 24 Nuuxna khamrigiisii wuu ka soo
miyirsaday, wuuna ogaaday wixii wiilkiisa yaru ku sameeyey.
25 Kolkaasuu yidhi, Inkaaru ha ku dhacdo Kancaan; Addoonkii

addoommaduu u noqon doonaa walaalihiis. 26 Oo wuxuu yidhi, Ammaanu ha u ahaato Rabbiga ah Ilaaha Sheem, Kancaanna addoon ha u noqdo. 27 Ilaah ha fidiyo Yaafed, Hana dego teendhooyinka Sheem; Kancaanna addoon ha u noqdo isaga. 28 Nuuxna daadka ka dib wuxuu sii noolaa saddex boqol iyo konton sannadood. 29 Wakhtigii Nuux noolaa oo dhammuna waxay ahaayeen sagaal boqol iyo konton sannadood; dabadeedna wuu dhintay.

**10** Haddaba kuwanu waa farcankii wiilashii Nuux, kuwaas oo ahaa Sheem, Xaam iyo Yaafed: oo wiilal baa u dhashay iyaga daadkii dabadiis. 2 Wiilashii Yaafed waxay ahaayeen Gomer, iyo Maajuuj, iyo Maaday, iyo Yaawaan, iyo Tubal, iyo Mesheg, iyo Tiiraas. 3 Wiilashii Gomerna waxay ahaayeen Ashkenas, iyo Riifad, iyo Togarmaah. 4 Wiilashii Yaawaanna waxay ahaayeen Eliishah, iyo Tarshiish, iyo Kitiim iyo Dodaaniim. 5 Kuwaasay jasiiradihii quruumuhu ugu kala qaybsameen waddammadoodii, dad kasta sidii afkoodii, iyo qabiilooyinkoodii, iyo quruumahoodii ay ahaayeen. 6 Wiilashii Xaamna waxay ahaayeen Kuush, iyo Misrayim, iyo Fuud, iyo Kancaan. 7 Wiilashii Kuushna waxay ahaayeen Sebaa, iyo Xawiilaah, iyo Sabtaah, iyo Racmaah, iyo Sabteka: wiilashii Racmaahna waxay ahaayeen Shebaa, iyo Dedaan. 8 Kuushna wuxuu dhalay Nimrod: wuxuuna bilaabay inuu noqdo mid dhulka xoog weyn ku leh. 9 Wuxuu ahaa ugaadhsade ku xoog weyn Rabbiga hortiisa: taas daraaddeed waxaa la yidhaahdaa, Sidii Nimrod ugaadhsade xoog weyn Rabbiga hortiisa. 10 Bilowgii boqortooyadiisu waxay ahayd Baabel, iyo Ereg, iyo Akad, iyo Kalneh, waxayna ku yiilleen waddankii Shincaar. 11 Dhulkaas wuu ka tegey oo wuxuu galay Ashuur, wuxuuna dhisay Nineweh, iyo Rexobod, iyo Kaalah, 12 iyo Resen oo u dhexeeyey Nineweh iyo Kaalah, (taasuna waxay tahay magaalada weyn). 13 Misrayimna wuxuu dhalay Luudiim, iyo Canaamiim, iyo Lehaabiim iyo Naftuxiim, 14 iyo Fatrusiim iyo Kasluxiim (oo ay reer Falastiin ka yimaadeen), iyo Kaftoriim. 15 Kancaanna wuxuu dhalay Siidoon oo ahaa curadkiisii, iyo Xeed; 16 iyo reer Yebuus, iyo reer Amor, iyo reer Girgaash; 17 iyo reer Xiwi, iyo reer Carqi, iyo reer Siini; 18 iyo reer Arwaad, iyo reer Semaar, iyo reer Xamaad: dabadeedna qabiilooyinkii Kancaan way kala firdheen. 19 Oo soohdintii reer Kancaan waxay ka bilaabmaysay Siidoon, markii loo kaco xagga Geraar, ilaa Gaasa, oo markii loo kaco xagga Sodom iyo Gomora iyo Admah iyo Seboyim, ilaa Laashac. 20 Kuwanu waxay ahaayeen wiilashii Xaam, sidii qabiilooyinkoodii, iyo afafkoodii, iyo waddammadoodii, iyo quruumahoodii ay ahaayeen. 21 Sheem oo aabbe u ahaa carruurtii Ceeber oo dhan, oo ahaa Yaafed walaalkiisii weynaa, isagana carruur baa u dhalatay. 22 Wiilashii Sheemna waxay ahaayeen Ceelaam, iyo Ashuur, iyo Arfaksad, iyo Luud, iyo Araam. 23 Wiilashii Araamna waxay ahaayeen Cuus, iyo Xuul, iyo Geter, iyo Mash. 24 Arfaksadna wuxuu dhalay Salah; Salahna wuxuu dhalay Ceeber. 25 Ceeberna waxaa u dhashay laba wiil: mid magiciisu wuxuu ahaa Feleg; waayo, waagiisii ayaa dhulku qaybsamay; magaca walaalkiisna wuxuu ahaa Yoqtaan. 26 Yoqtaanna wuxuu dhalay Almoodaad, iyo Shelef, iyo Xasarmaawed, iyo Yerah; 27 iyo Hadooraam, iyo Uusaal, iyo Diqlah; 28 iyo Coobaal, iyo Abiimaa'el, iyo Shebaa; 29 iyo Oofir, iyo Xawiilaah, iyo Yoobaab: kuwaasu kulli waxay ahaayeen wiilashii Yoqtaan. 30 Meeshay degganaayeenna waxay ka bilaabmaysay Meesha, markii loo kaco xagga Sefaar, buurta bari. 31 Kuwanu waxay ahaayeen wiilashii Sheem; sidii qabiilooyinkoodii, iyo afafkoodii, iyo waddammadoodii, iyo quruumahoodii ay ahaayeen. 32 Kuwanu waa qabiilooyinkii wiilashii Nuux; sidii farcankoodii iyo quruumahoodii ay ahaayeen; oo kuwanaa quruumuhu ka kala qaybsameen daadkii dabadiis.

**11** Dhulka oo dhammuna wuxuu ahaa isku af iyo isku hadal keliya. 2 Waxaana dhacday markay xagga bari u sii socdaaleen inay waddankii Shincaar meel bannaan ka heleen; oo halkaas ayay degeen. 3 Oo waxay isku yidhaahdeen, Ina keena, aynu leben samaysannee, oo aynu aad u dubnee. Oo waxay dhagaxa meeshiisa u haysteen leben, nuuradda meesheedana dhoobo. 4 Oo waxay yidhaahdeen, Ina keena, aynu magaalo dhisannee, iyo munaarad dhaladeedu samada gaadho, oo aynu magac yeelannee, waaba intaasoo aynu dhulka dushiisa oo dhan ku kala firidhnaaye. 5 Rabbiguna wuxuu u soo degay inuu arko magaaladii iyo munaaraddii ay binu-aadmigu dhisayeen. 6 Oo Rabbigu wuxuu yidhi, Bal eega, iyagu waa isku dad keliya, oo dhammaan isku af keliya bay leeyihiin, oo waxanuna waa waxa ay bilaabayaan inay sameeyaan, oo haatan wax ka hor joogsan doona waxay damcaan inay sameeyaan ma jiraane. 7 Ina keena, aynu degnee, oo halkaas aynu afkooda iskaga qasnee, yaan midna midka kale hadalkiisa garanine. 8 Kolkaasaa Rabbigu halkaas ka kaxeeyey oo ku kala firdhiyey dhulka dushiisa oo dhan, oo dhisiddii magaaladii way joojiyeen. 9 Sidaas daraaddeed magaceedii waxaa loo bixiyey Baabel, maxaa yeelay, halkaasaa Rabbigu afkii dhulka oo dhan iskaga qasay; oo halkaasuu Rabbigu ka kaxeeyey iyagii oo ku kala firdhiyey dhulka dushiisa oo dhan. 10 Kuwanu waa farcankii Sheem. Sheem wuxuu jiray boqol sannadood, oo laba sannadood oo daadkii ka dambaysay

wuxuu dhalay Arfaksad. 11 Sheemna markuu Arfaksad
dhalay ka dib wuxuu noolaa shan boqol oo sannadood,
wiilal iyo gabdhona wuu dhalay. 12 Arfaksadna wuxuu jiray
shan iyo soddon sannadood, wuxuuna dhalay Salah: 13
Arfaksadna markuu Salah dhalay ka dib wuxuu noolaa
afar boqol iyo saddex sannadood, wiilal iyo gabdhona wuu
dhalay. 14 Salahna wuxuu jiray soddon sannadood, wuxuuna
dhalay Ceeber. 15 Salahna markuu Ceeber dhalay ka dib
wuxuu noolaa afar boqol iyo saddex sannadood, wiilal iyo
gabdhona wuu dhalay. 16 Ceeberna wuxuu jiray afar iyo
soddon sannadood, wuxuuna dhalay Feleg: 17 Ceeberna
markuu Feleg dhalay ka dib wuxuu noolaa afar boqol iyo
soddon sannadood, wiilal iyo gabdhona wuu dhalay. 18
Felegna wuxuu jiray soddon sannadood, wuxuuna dhalay
Recu: 19 Felegna markuu Recu dhalay ka dib wuxuu noolaa
laba boqol iyo sagaal sannadood, wiilal iyo gabdhona wuu
dhalay. 20 Recuna wuxuu jiray laba iyo soddon sannadood,
wuxuuna dhalay Seruug. 21 Recuna markuu Seruug dhalay
ka dib wuxuu noolaa laba boqol iyo toddoba sannadood,
wiilal iyo gabdhona wuu dhalay. 22 Seruugna wuxuu jiray
soddon sannadood, wuxuuna dhalay Naaxoor: 23 Seruugna
markuu Naaxoor dhalay ka dib wuxuu noolaa laba boqol oo
sannadood, wiilal iyo gabdhona wuu dhalay. 24 Naaxoorna
wuxuu jiray sagaal iyo labaatan sannadood, wuxuuna dhalay
Terax; 25 Naaxoorna markuu Terax dhalay ka dib wuxuu
noolaa boqol iyo sagaal iyo toban sannadood, wiilal iyo
gabdhona wuu dhalay. 26 Teraxna wuxuu jiray toddobaatan
sannadood, wuxuuna dhalay Aabraam, iyo Naaxoor, iyo
Haaraan. 27 Kuwanu waa farcankii Terax. Terax wuxuu
dhalay Aabraam, iyo Naaxoor, iyo Haaraan; Haaraanna
wuxuu dhalay Luud. 28 Haaraanna wuxuu dhintay aabbihiis
Terax oo jooga, wuxuuna ku dhintay dhulkii uu ku dhashay,
oo la odhan jiray Uur tii reer Kaldayiin. 29 Aabraam iyo
Naaxoorna way guursadeen: Aabraam naagtiisii waxaa la
odhan jiray Saaray; naagtii Naaxoorna waxaa la odhan jiray
Milkah, waxayna ahayd gabadhii Haaraan, aabbihii Milkah
iyo Iskah. 30 Saaraynа waxay ahayd madhalays; ilmona ma
ay lahayn. 31 Teraxna wuxuu kaxaystay wiilkiisii Aabraam,
iyo Luud oo ahaa ina Haaraan, wiilkii wiilkiisii, iyo Saaray
oo uu soddog u ahaa, oo ahayd naagtii wiilkiisii Aabraam;
wayna kala baxeen Uur tii reer Kaldayiin, si ay u tagaan
dalkii Kancaan; waxayna yimaadeen Haaraan, oo halkaasay
degeen. 32 Wakhtigii Terax noolaa wuxuu ahaa laba boqol
iyo shan sannadood, Teraxna wuxuu ku dhintay Haaraan.

12 Rabbigu wuxuu Aabraam ku yidhi, Ka tag
waddankaaga, iyo xigaalkaaga, iyo reerka aabbahaaba,
oo dalka aan ku tusi doono u kac. 2 Oo quruun weyn
baan kaa dhigi doonaa, oo waan ku barakayn doonaa,
magacaagana waan weynayn doonaa; oo waxaad noqon
doontaa barako; 3 oo waan barakayn doonaa kuwa kuu
duceeya, kan ku habaarana waan habaari doonaa: oo
qabiilooyinka dhulka oo dhammu adigay kugu barakoobi
doonaan. 4 Markaasaa Aabraam tegey, sidii Rabbigu ku
yidhi; Luudna wuu raacay. Aabraam shan iyo toddobaatan
sannadood buu jiray markuu Haaraan ka tegey. 5 Aabraamna
wuxuu kaxaystay naagtiisii Saaray, iyo Luud oo ahaa wiilkii
walaalkiis, iyo xoolahoodii ay urursadeen oo dhan, iyo
dadkii ay Haaraan ka heleen oo dhan; kolkaasay u kaceen
dalkii Kancaan, oo waxay yimaadeen dalkii Kancaan. 6
Aabraamna dalkii buu dhex maray ilaa meeshii la odhan
jiray Shekem iyo tan iyo geedkii Moreh. Wakhtigaasna
reer Kancaan dalkay joogeen. 7 Oo Ilaah baa Aabraam u
muuqday, oo ku yidhi, Dalkan farcankaagaan siin doonaa.
Kolkaasuu meeshaas meel allabari uga dhisay Rabbigii u
muuqday. 8 Markaasuu meeshaas ka guuray, oo wuxuu
tegey buurtii xagga bari ka ahayd Beytel, oo teendhadiisii
buu ka dhistay meel Beytel galbeed ka ahayd, Aaciina bari
ka ahayd; markaasuu meeshaas meel allabari Rabbiga uga
dhisay, oo magaca Rabbiga ku baryootamay. 9 Kolkaasaa
Aabraam socdaalay, isagoo weli xagga koonfureed u sii
socda. 10 Kolkaasaa dhulkii abaari ka dhacday: markaasuu
Aabraam Masar tegey; inuu halkaas qariib ku ahaado,
waayo, abaartii aad bay dhulkii ugu xumayd. 11 Oo waxay
noqotay in markii uu ku soo dhowaaday inuu Masar galo,
uu ku yidhi naagtiisii Saaray, Bal eeg, waan ogahay inaad
tahay naag arag quruxsan, 12 oo waxaa dhici doona in
markii ay Masriyiintu ku arkaan, ay odhan doonaan, Waa
naagtiisii tanu. Oo way i dili doonaan, laakiin adiga way
ku dayn doonaan. 13 Waxaad ku tidhaahdaa, Walaashiis
baan ahay; si ay iigu roonaadaan adiga aawadaa, oo ay
naftaydu daraaddaa u noolaato. 14 Oo waxay noqotay in
markii Aabraam Masar soo galay, ay Masriyiintii arkeen
in naagtu aad u quruxsan tahay. 15 Oo amiirradii Fircoon
baa arkay, oo Fircoon bay u ammaaneen iyadii, oo naagtii
waxaa loo kaxeeyey gurigii Fircoon. 16 Isaguna Aabraam si
wanaagsan buu u qabtay iyada aawadeed: wuxuuna lahaa
ido, iyo dibiyo, iyo dameerro lab, iyo niman addoommo ah,
iyo naago addoommo ah, iyo dameerro dhaddig iyo geel. 17
Oo Rabbigu belaayooyin waaweyn buu ku riday Fircoon iyo
reerkiisiiba, Saaray oo naagtii Aabraam ahayd aawadeed. 18
Fircoonna Aabraam buu u yeedhay, oo ku yidhi, Waa maxay
waxan aad igu samaysay? Maxaad iigu sheegi weyday inay
tahay naagtaadii? 19 Maxaad u tidhi, Waa walaashay si aan

u guursado iyada? Haddaba waa tan naagtaadii, kaxayso oo
iska tag. 20 Fircoonna niman buu u soo amray isaga: wayna
soo ambabbixiyeen isagii iyo naagtiisii, iyo wuxuu haystay
oo dhan.

**13** Aabraamna Masar wuu ka baxay, isaga, iyo naagtiisii,
iyo wuxuu haystay oo dhan, Luudna wuu raacay, oo
wuxuu tegey xagga koonfureed. 2 Oo Aabraam hodan
buu ka ahaa xagga xoolaha iyo lacagta iyo dahabka. 3
Xagga koonfureed ayuu ka tegey oo wuxuu u socdaalay
ilaa Beytel, meeshii bilowgii ay teendhadiisu ahayd, ee
u dhexaysay Beytel iyo Aacii; 4 ilaa meeshii allabariga
oo uu horraantii halkaas ka sameeyey; oo meeshaasuu
Aabraam magaca Rabbiga kaga baryootamay. 5 Oo Luud,
oo isna Aabraam la socday, wuxuu lahaa adhi, iyo lo',
iyo teendhooyin. 6 Dhulkuna ma uu qaadi karin iyagii,
hadday wada degganaan lahaayeen: waayo, xoolahoodu
way badnaayeen, oo sidaas daraaddeed ma ay wada
degganaan karin. 7 Dirir baana ku dhex jirtay xoolojirradii
Aabraam iyo xoolojirradii Luud. Markaasna reer Kancaan
iyo reer Feris dhulkaasay degganaayeen. 8 Oo Aabraam
wuxuu Luud ku yidhi, Waxaan kaa baryayaa inaan diriru
inaga dhex dhicin aniga iyo adiga, iyo xoolojirradayda iyo
xoolojirradaada; maxaa yeelay, waxaynu nahay walaalo. 9
Dhulka oo dhammu sow kaa ma horreeyo? Waxaan kaa
baryayaa inaad iga guurtid. Haddaad bidixda tagto, midigtaan
tegayaa; haddaad midigta tagtona, bidixdaan tegayaa. 10
Kolkaasuu Luud indhihiisii kor u taagay, oo wuxuu arkay
Bannaankii Webi Urdun oo dhan, iyo inay meel waluba aad
u waraabsan tahay, intaan Rabbigu baabbi'in Sodom iyo
Gomora; wuxuu u ekaa beertii Ilaah, iyo sida dalka Masar
markaad tagto xagga Socar. 11 Markaasuu Luud wuxuu
doortay Bannaankii Urdun oo dhan; oo Luud xagga bari
buu u socdaalay; oo way kala guureen. 12 Aabraam wuxuu
degay dalkii Kancaan, Luudna wuxuu degay magaalooyinkii
Bannaanka ku yiil, oo teendhadiisii wuxuu u wareejiyey
xagga Sodom. 13 Haddaba dadkii Sodom shar miidhan bay
ahaayeen, Ilaahna aad iyo aad bay ugu dembaabeen. 14 Oo
Rabbigu wuxuu Aabraam ku yidhi, intii Luud ka guuray ka
dib, Indhahaaga kor u taag, oo meeshaad joogto ka fiiri,
xagga woqooyi iyo xagga koonfureed, iyo xagga bari iyo
xagga galbeedba; 15 waayo, dhulka aad aragto oo dhan
waxaan siin doonaa adiga iyo farcankaaga weligiin. 16
Farcankaagana waxaan ka dhigi doonaa sida ciidda dhulka;
haddii nin ciidda dhulka tirin karo, farcankaagana waa la
tirin doonaa. 17 Bal kac oo ku dhex soco dhulka dhererkiisa
iyo ballaadhkiisa; waayo, adigaan ku siin doonaa. 18 Oo
Aabraam teendhadiisii wuu wareejiyey, oo wuxuu yimid
oo degay dhirtii Mamre, ee ku tiil Xebroon, oo halkaasuu
Rabbiga meel allabari uga dhisay.

**14** Oo waxaa dhacday waagii Amraafel boqorka u
ahaa Shincaar, Aryoogna boqorka u ahaa Ellaasaar,
Kedorlaacomerna boqorka u ahaa Ceelaam, Tidcaalna
boqorka u ahaa Goyiim, 2 inay la dirireen Berac oo boqor
u ahaa Sodom, iyo Birshac oo boqor u ahaa Gomora, iyo
Shinaab oo boqor u ahaa Admah, iyo Shemeeber oo boqor u
ahaa Seboyim, iyo boqorkii Belac (oo iyana ahayd Socar). 3
Kuwanu waxay kulligood isugu yimaadeen Dooxo Siddiim (oo
iyana ahayd Baddii Cusbada). 4 Laba iyo toban sannadood
bay Kedorlaacomer u adeegeen, markaasay sannaddii
saddex iyo tobnaad ku caasiyoobeen. 5 Sannaddii afar iyo
tobnaadna waxaa yimid Kedorlaacomer, iyo boqorradii la
jiray, oo waxay reer Refaa'iim ku dileen Cashterod Qarnayim,
oo reer Suusiimna waxay ku dileen Haam, oo reer Eymiimna
waxay ku dileen Shaweh Qiryaatayim, 6 reer Xorna waxay
ku dileen buurtoodii Seciir, iyo ilaa Aylfaaraan oo u dhowayd
cidlada. 7 Oo way soo noqdeen, oo waxay yimaadeen
Ceyn Mishfaad (oo iyana ahayd Qaadeesh), oo waxay
dileen dadkii dalkii reer Camaaleq oo dhan, waxaa kale oo
ay dileen reer Amor oo degganaa Hasason Tamar. 8 Oo
waxaa soo baxay boqorkii Sodom, iyo boqorkii Gomora, iyo
boqorkii Admah, iyo boqorkii Seboyim, iyo boqorkii Belac
(oo iyana ahayd Socar); oo waxay Dooxo Siddiim ugu
diyaargaroobeen inay la dagaallamaan 9 Kedorlaacomer
oo ahaa boqorkii Ceelaam, iyo Tidcaal oo ahaa boqorkii
Goyiim, iyo Amraafel oo ahaa boqorkii Shincaar, iyo Aryoog
oo ahaa boqorkii Ellaasaar. Waxay ahaayeen afar boqor oo
shantii boqor ka gees ah. 10 Haddaba Dooxo Siddiim waxaa
ka buuxay boholo waaweyn oo dhoobo ah; oo boqorradii
Gomora iyo Sodom way carareen, oo halkaasay ku dhaceen,
intii kalena waxay u carareen xagga buurta. 11 Oo waxay
qaateen alaabtii Sodom iyo Gomora oo dhan, iyo cuntadoodii
oo dhan, wayna iska tageen. 12 Oo waxaa kaloo ay la
tageen Luud, oo ahaa wiilkii Aabraam walaalkiis, oo Sodom
degganaa, iyo alaabtiisii oo dhan, wayna iska tageen. 13
Oo waxaa yimid mid soo baxsaday, oo wuxuu u warramay
Aabraam kii ahaa Cibraaniga isagoo ag deggan dhirtii Mamre
kii ahaa reer Amor, oo Eshkol iyo Caaneer walaalkood ahaa.
Kuwaasu Aabraam bay gaashaanbuur la ahaayeen. 14 Oo
Aabraam markuu maqlay in walaalkiis maxbuus ahaan loola
tegey ayuu soo kaxaystay raggiisii la tababbaray oo gurigiisa
ku dhashay, iyagoo ah saddex boqol iyo siddeed iyo toban
nin, oo wuxuu raacdo ku jiray ilaa Daan. 15 Oo habeennimo

ayuu raggiisii u kala qaybiyey, isaga iyo addoommadiisiiba,
oo waxay laayeen colkii, oo ay raacdaysteen ilaa Xoobah,
oo Dimishaq xagga bidixda ka ah. **16** Oo alaabtii oo dhan
buu soo celiyey, oo waxaa kale oo uu soo celiyey walaalkiis
Luud, iyo alaabtiisii, iyo naagihii, iyo dadkiiba. **17** Markuu ka
soo noqday layntii Kedorlaacomer iyo boqorradii la jiray ka
dib ayaa boqorkii Sodom Aabraam kaga hor tegey Dooxo
Shaweh oo ahayd Dooxadii Boqorka. **18** Oo Malkisadaq oo
ahaa boqorkii Saalem baa keenay cunto iyo khamri: wuxuuna
ahaa wadaadkii Ilaaha ugu sarreeya. **19** Oo Aabraam buu u
duceeyay, oo yidhi, Ilaaha ugu sarreeya, ee leh samada iyo
dhulkaba ha barakeeyo Aabraam. **20** Ammaan waxaa leh
Ilaaha ugu sarreeya, oo cadaawayaashaadii gacantaada
geliyey. Markaasaa Aabraam wuxuu isagii wax kasta ka
siiyey toban meelood oo meel. **21** Boqorkii Sodom wuxuu
Aabraam ku yidhi, Dadka uun i sii, alaabtana adigu iska
qaado. **22** Laakiin Aabraam wuxuu boqorkii Sodom ku
yidhi, Gacantaydaan kor u taagay oo waxaan ku dhaartay
Rabbiga, kan ah Ilaaha ugu sarreeya, ee leh samada iyo
dhulka, **23** inaanan qaadanin miiq ama kab yeelmeheed
ama wax adigu aad leedahay, waayo, waaba intaasoo aad
tidhaahdaa, Anaa Aabraam hodan ka dhigaye. **24** Waxba
qaadan maayo wixii ay ragga dhallinyarada ahu cuneen
mooyaane, iyo qaybtii raggii i raacay. Caaneer iyo Eshkol,
iyo Mamre ha qaateen qaybtooda.

**15** Waxyaalahaas ka dib ereygii Ilaah baa Aabraam
ugu yimid muuqasho ahaan, isagoo leh, Aabraamow,
ha baqin: anigu waxaan ahay gaashaankaaga,
abaalgudkaaguna aad buu u weynaan doonaa. **2** Oo
Aabraam wuxuu yidhi, Sayidow Rabbiyow, maxaad i siin
doontaa? Waayo, anigu carruurla'aan baan sii socdaa,
reerkaygana waxaa dhaxli doona Eliiceser oo ah reer
Dimishaq. **3** Oo Aabraam wuxuu yidhi, Bal eeg, aniga ima
aad siin farcan: oo mid gurigayga ku dhashay baa i dhaxlaya.
**4** Oo bal eeg, ereygii Rabbigaa u yimid, isagoo leh, Ninkanu
kuma dhaxli doono: laakiinse waxaa ku dhaxli doona wiil aad
dhali doontid. **5** Oo dibadduu u soo bixiyey, oo ku yidhi, Bal
samada fiiri, oo xiddigaha tiri, haddaad tirin kartid: oo wuxuu
ku yidhi, Sidaas oo kalaa farcankaagu ahaan doonaa. **6** Oo
Rabbiga wuu rumaystay; Ilaahna taas wuxuu ugu tiriyey
xaqnimo. **7** Oo wuxuu ku yidhi isaga, Anigu waxaan ahay
Rabbiga kaaga soo kaxeeyey Uur tii reer Kaldayiin, inaan
ku siiyo dalkan si aad u dhaxashid. **8** Oo Aabraam wuxuu
yidhi, Sayidow Rabbiyow, maxaan ku ogaadaa inaan dhaxli
doono? **9** Oo wuxuu ku yidhi, Ii kaxee qaalin lo' ah oo saddex
jir ah, iyo ceesaan saddex jir ah, iyo wan saddex jir ah, iyo
qoolley, iyo xamaam yar. **10** Oo wuu u kaxeeyey kuwaas oo
dhan, oo badhtankuu ka kala wada gooyay, oo badh kastaba
kan kaluu hor dhigay: laakiinse shimbirrihii ma uu kala gooyn.
**11** Haad baana hilibkii ku soo degtay, laakiinse Aabraam
baa ka eryay. **12** Oo kolkii qorraxdu sii dhacaysay, ayaa
hurdo aad u weynu Aabraam ku soo dhacday; oo bal eeg,
cabsi gudcur weyn leh baa ku soo degtay. **13** Markaasuu
wuxuu ku yidhi Aabraam, Ogow in hubaal farcankaagu ay
dad qalaad ku ahaan doonaan dal aan kooda ahayn, oo ay
u adeegi doonaan, oo afar boqol oo sannadood waa la dhibi
doonaa; **14** oo weliba quruuntaas ay u adeegi doonaan,
xukun baan ku ridi doonaa; oo dabadeedna way ka soo
bixi doonaan iyagoo xoolo badan wata. **15** Laakiinse adigu
nabad baad ugu tegi doontaa awowayaashaa, oo waxaa
lagu xabaali doonaa adigoo cimri dheer gaadhay. **16** Oo
iyagu qarniga afraad halkan bay ku soo noqon doonaan:
waayo, dembigii reer Amor weli ma dhamma. **17** Oo waxay
noqotay, markii qorraxdii dhacday oo ay ahayd gudcur, in
girgire qiiqaya iyo dab ololaya ay dhex mareen cadadkii. **18**
Maalintaas Rabbigu Aabraam buu axdi la dhigtay, isagoo
leh, Farcankaagaan siiyey dhulkan, oo laga bilaabo webiga
Masar ilaa webiga weyn, oo ah webi Yufraad: **19** reer Qeyn,
iyo reer Qenas, iyo reer Qadmon, **20** iyo reer Xeed, iyo reer
Feris, iyo reer Refaa'iim, **21** iyo reer Amor, iyo reer Kancaan,
iyo reer Girgaash, iyo reer Yebuus.

**16** Saaray oo ahayd Aabraam naagtiisii carruur uma ay
dhalin isagii: waxayna lahayd gabadh midiidin ah, oo
Masriyad ah, magaceedana waxaa la odhan jiray Haagaar.
**2** Oo Saaray waxay Aabraam ku tidhi, Bal eeg imminka,
Rabbigu waa ii diiday inaan dhalo; haddaba waxaan kaa
baryayaa inaad midiidintayda u tagto, mindhaa iyadaan
carruur ka heli doonaaye, Aabraamna codkii Saaray buu
maqlay. **3** Saaray oo ahayd naagtii Aabraam waxay kaxaysay
Haagaar tii Masriyadda ahayd, oo midiidinteeda ahayd,
markii Aabraam toban sannadood joogay dalkii Kancaan ka
dib, oo waxay iyadii siisay ninkeedii Aabraam inay naagtiisii
u noqoto. **4** Oo Haagaar buu u tegey, wayna uuraysatay; oo
markay aragtay inay uuraysatay ayay murwadeedii aad u
quudhsatay. **5** Oo Saaray waxay Aabraam ku tidhi, Dulmigii
laygu sameeyey dushaada ha ahaado: midiidintaydii waxaan
geliyey laabtaada; oo markay aragtay inay uuraysatay
ayay i quudhsatay; Rabbigu aniga iyo adiga ha ina kala
xukumo. **6** Laakiinse Aabraam wuxuu ku yidhi Saaray,
Bal eeg, midiidintaadii gacantaaday ku jirtaaye; waxaad
doonto ku samee. Saarayna si adag bay ula macaamilootay,
kolkaasay midiidintii ka carartay horteeda. **7** Oo malaa'igtii

Rabbigaa heshay iyadoo ag joogta il biyo ah oo cidlada ku
taal, oo ishuna waxay ku tiil jidka Shuur. **8** Oo malaa'igtii
waxay ku tidhi, Haagaar, midiidintii Saaray, xaggee baad
ka timid? Xaggee baadse ku socotaa? Oo waxay ku tidhi,
Murwadayda Saaray baan ka cararayaa. **9** Oo malaa'igtii
Rabbigu waxay ku tidhi iyadii, Ku noqo murwadaadii, oo
gacmaheeda is-hoos dhig. **10** Oo malaa'igtii Rabbigu waxay
ku tidhi iyadii, Farcankaaga aad baan u tarmin doonaa
si aan loo tirin karin farabadnaantiisa aawadeed. **11** Oo
malaa'igtii Rabbigu waxay ku tidhi iyadii, Bal eeg, uur baad
leedahaye, oo wiil baad dhali doontaa; magiciisana waxaad
u bixin doontaa Ismaaciil, maxaa yeelay, Rabbigu waa
maqlay dhibaatadaadii. **12** Oo dadka dhexdiisa wuxuu ku
noqon doonaa sida dameer banjoog ah; gacantiisu nin walba
gees bay ka noqon doontaa, oo nin walba gacantiisuna
gees bay ka noqon doontaa isaga; wuxuuna degganaan
doonaa walaalihiis oo dhan hortooda. **13** Oo waxay magicii
Rabbigii la hadlay iyada u bixisay, Waxaad tahay Ilaaha
wax arka, waayo, waxay tidhi, Weliba miyaan halkan ka
arkay kan i arka? **14** Sidaas daraaddeed ceelkii waxaa
loo bixiyeyBi'ir Lahayroy; bal eeg, wuxuu u dhexeeyaa
Qaadeesh iyo Bered. **15** Oo Haagaar waxay Aabraam
u dhashay wiil; oo Aabraamna wuxuu wiilkiisii Haagaar
dhashay u bixiyey Ismaaciil. **16** Aabraamna wuxuu jiray lix
iyo siddeetan sannadood, markii ay Haagaar Ismaaciil u
dhashay Aabraam.

**17** Oo markuu Aabraam jiray sagaal iyo sagaashan
sannadood ayaa Rabbigu u muuqday, oo wuxuu ku
yidhi, Waxaan ahay Ilaaha Qaadirka ah; hortayda ku soco, oo
mid eed la' ahow. **2** Oo axdigaygaan kula dhigan doonaa, oo
anigu aad baan kuu tarmin doonaa. **3** Markaasuu Aabraam
wejiga u dhacay; oo Ilaah baa la hadlay isagoo ku leh, **4** Bal
eeg, axdigaygii waa kula jiraaye, oo adigu quruumo badan
baad aabbe u noqon doontaa. **5** Magacaagana mar dambe
lama odhan doono Aabraam, laakiinse magacaagu wuxuu
noqon doonaa Ibraahim; waayo, waxaan kaa dhigay quruumo
badan aabbahood. **6** Aad baanan kuu badin doonaa, oo
quruumo baan kaa samayn doonaa, boqorrona way kaa
soo bixi doonaan. **7** Oo axdigayga waxaan ku adkayn
doonaa dhexdeenna iyo farcankaaga kaa dambeeyaba,
tan iyo qarniyadooda oo dhan, waana axdi weligiis waara,
kaas oo ah inaan adiga Ilaah kuu noqdo iyo farcankaaga
kaa dambeeya. **8** Oo waxaan ku siin doonaa, adiga iyo
farcankaaga kaa dambeeyaba, dhulkii aad sodcaalka ku
ahayd, kaas oo ah dalka Kancaan oo dhan inuu idiin ahaado
hanti aad weligiin lahaataan; aniguna waxaan ahaan doonaa
Ilaahood. **9** Oo Ilaah wuxuu Ibraahim ku yidhi, Adiguna
waa inaad axdigayga xajisaa, adiga iyo farcankaaga kaa
dambeeyaba, tan iyo qarniyadooda oo dhan. **10** Kanu waa
axdigayga aad xajin doontaan, oo inoo dhexeeya aniga iyo
adiga iyo farcankaaga kaa dambeeyaba; mid kasta oo lab oo
idinku jira waa in la gudaa. **11** Oo waxaad iska gudi doontaan
buuryadiinna; waxayna calaamo u noqon doontaa axdiga
ina dhex yaal aniga iyo idinka. **12** Kii siddeed maalmood
jira oo idinku dhex jira waa in la gudaa, mid kasta oo lab
tan iyo qarniyadiinna oo dhan, ha ahaado kii gurigaaga ku
dhasha ama kii lacag lagaga soo iibsado shisheeyaha oo
aan farcankaaga ahayn. **13** Kii gurigaaga ku dhasha, iyo kii
lacagtaada lagu iibsadoba, waa in la gudaa: axdigayguna
wuxuu jidhkiinna ku noqon doonaa axdi weligiis waara.
**14** Oo buuryoqabka lab oo aan buuryadiisa laga gooynin,
midkaasu waa ka go'i doonaa dadkiisa; waayo, axdigaygii
buu jebiyey. **15** Oo Ilaah wuxuu Ibraahim ku yidhi, Naagtaada
Saarayna magaceeda waa inaadan ugu yeedhin Saaray,
laakiinse magaceedu wuxuu ahaan doonaa Saarah. **16**
Oo iyadaan barakayn doonaa, oo weliba wiil baan kaa siin
doonaa; iyadaan barakayn doonaa, oo waxay noqon doontaa
quruumo hooyadood; boqorrada dadyowguna iyaday ka
iman doonaan. **17** Markaasuu Ibraahim wejiga u dhacay, oo
qoslay, oo qalbigiisa wuxuu iska yidhi, Ma ilmaa u dhalan
doona nin boqol jir ah? Oo Saarah oo sagaashan jir ihi miyey
dhali doontaa? **18** Oo Ibraahim wuxuu Ilaah ku yidhi, Waxaan
jeclaan lahaa in Ismaaciil hortaada ku noolaado! **19** Oo Ilaah
wuxuu yidhi, Maya, laakiin naagtaada Saarah wiil bay kuu
dhali doontaa, magiciisana waxaad u bixin doontaa Isxaaq;
oo waxaan isaga ku adkayn doonaa axdigayga, kaas oo
farcankiisa ka dambeeya u ahaan doona axdi weligiis waara.
**20** Xagga Ismaaciilna waan ku maqlay; oo bal eeg, isaga
waan barakeeyey, waanan badin doonaa, oo aad baan u
tarmin doonaa isaga; laba iyo toban amiir buu dhali doonaa,
oo quruun weyn baan ka dhigi doonaa. **21** Laakiin axdigayga
waxaan ku adkayn doonaa Isxaaq kan Saarah kuu dhali
doonto sannadda soo socota xilligan oo kale. **22** Oo kolkuu
hadalkii u dhammeeyey, Ilaah waa ka tegey Ibraahim. **23**
Markaasaa Ibraahim wuxuu kaxaystay wiilkiisii Ismaaciil, iyo
intii gurigiisa ku dhalatay oo dhan, iyo kuwii lacagtiisa lagu
iibsaday oo dhan, kulli intii labayd oo ka midka ahayd dadkii
guriga Ibraahim joogay, oo isla maalintaas ayuu ka guday
buuryadoodii sidii Ilaah ku yidhi isaga. **24** Oo Ibraahim wuxuu
jiray sagaal iyo sagaashan sannadood markii laga guday
buuryadiisii. **25** Wiilkiisii Ismaaciilna wuxuu jiray saddex iyo
toban sannadood markii buuryadiisii laga guday. **26** Oo isla
maalintaas baa la guday Ibraahim iyo wiilkiisii Ismaaciil.

27 Oo raggii gurigiisa joogay oo dhan, kuwii gurigiisa ku
dhashay, iyo kuwii lacagtiisii shisheeyaha lagaga iibsadayba
waa lala guday isaga.

18 Oo Rabbigaa u muuqday isaga oo ag jooga dhirtii
Mamre, isagoo iridda teendhada fadhiya markii maalinta
ugu kululayd. 2 Oo indhihiisii buu kor u taagay oo eegay,
oo wuxuu arkay saddex nin oo hortiisa taagan: oo kolkuu
arkay, ayuu ka orday iriddii teendhada inuu ka hor tago
iyagii, kolkaasuu dhulka ku sujuuday, 3 oo wuxuu yidhi,
Sayidkaygiiyow, haddaad raalli iga tahay, ha i dhaafin
anigoo addoonkaaga ah. 4 Biyo yar ha laydiin keeno, oo
cagamaydha, oo geedka hoostiisa ku nasta: 5 oo waxaan
idiin keeni doonaa wuxoogaa cunto ah, ee raaxaysta; waayo,
waxaad u timaadeen addoonkiinna; markaas ka dib waad
tegi doontaan. Oo waxay ku yidhaahdeen, Yeel sidaad tidhi.
6 Ibraahimna dhaqsuu u galay teendhadii, oo Saarah u tegey,
oo wuxuu ku yidhi, Saddex koombo oo bur ah degdeg u
diyaari, oo cajiin, oo kibis ka samee. 7 Oo Ibraahim xagga
lo'dii buu ku orday, oo wuxuu soo kaxeeyey dibi yar oo dhaylo
ah oo wanaagsan, oo wuxuu u dhiibay nin dhallinyaro ah,
isaguna dhaqsuu u diyaariyey. 8 Kolkaasuu u qaaday subag,
iyo caano, iyo dibigii uu diyaariyey, oo hortooduu dhigay;
isna dhinacooduu istaagay geedkii hoostiisii; iyana way
cuneen. 9 Oo waxay ku yidhaahdeen, Meeday bilcantaadii
Saarah? Markaasuu yidhi, Waa taa; teendhaday ku jirtaa. 10
Wuxuuna ku yidhi, Hubaal waan kuu soo noqon doonaa
markii xilligu soo wareego; oo bal ogow, naagtaada Saarah
wiil bay dhali doontaaye. Saarahna way maqashay, iyadoo
joogta iriddii teendhada oo ka dambaysay isaga. 11 Haddaba
Ibraahim iyo Saarah way da' weynaayeen; gabow bayna la
dhaceen; caadadii naaguhuna Saarah way ka joogsatay.
12 Saarahna qalbigay ka qososhay, iyadoo leh, Ma anigoo
gaboobay baan farxad heli doonaa, iyadoo sayidkayguna
gaboobay? 13 Rabbiguna wuxuu Ibraahim ku yidhi, Saarah
maxay u qososhay, iyadoo leh, Runtii ma ilmaan dhali
doonaa, anoo gaboobay? 14 Ma wax Rabbiga ku adag baa
jira? Wakhtigii la ballamay baan kugu soo noqon doonaa,
markii xilligu soo wareego, oo Saarah wiil bay dhali doontaa.
15 Markaasaa Saarah dafirtay oo tidhi, Ma aan qoslin;
maxaa yeelay, way cabsatay. Oo isna wuxuu yidhi, Maya,
laakiin waad qososhay. 16 Nimankiina halkaas way ka
kaceen, oo waxay u jeesteen xagga Sodom: Ibraahimna
wuu raacay inuu sagootiyo iyaga. 17 Rabbiguna wuxuu
yidhi, Miyaan Ibraahim ka qariyaa waxaan samaynayo,
18 Maxaa yeelay, hubaal Ibraahim wuxuu noqon doonaa
quruun weyn oo xoog leh, oo quruumaha dhulka oo dhammu
isagay ku barakoobi doonaan? 19 Waayo, waan garanayaa
isaga, inuu carruurtiisa iyo kuwa gurigiisa jooga ku amri
doono, inay jidka Rabbiga xajiyaan inay sameeyaan xaqnimo
iyo caaddilnimo; si uu Rabbigu Ibraahim ugu soo dejiyo
wixii uu kaga hadlay. 20 Rabbiguna wuxuu yidhi, Qaylada
Sodom iyo Gomora way badatay, dembigooduna aad buu u
weynaaday. 21 Haddaba waan degi doonaa, oo waxaan
arki doonaa inay wada sameeyeen sida qayladu ii soo
gaadhay iyo in kale; haddaanay wada samaynna, waan
ogaan doonaa. 22 Oo nimankii halkaasay ka noqdeen oo
waxay tageen xagga Sodom: laakiinse Ibraahim weli wuxuu
hor taagnaa Rabbiga. 23 Oo Ibraahim baa u dhowaaday,
oo yidhi, Miyaad kuwa xaqa ah la baabbi'inaysaa kuwa
sharka fala? 24 Mindhaa waxaa magaalada jooga konton
xaq ah. De miyaad baabbi'inaysaa meesha oo aadan ugu
tudhaynin kontonka xaqa ah ee jooga aawadood? 25 Yaanay
noqon inaad sidaas samayso, inaad kuwa xaqa ah la dishid
kuwa sharka fala, oo sidaas kuwa xaqa ahu ay kula mid
noqdaan kuwa sharka fala, taas yaanay noqon. Dunida
oo dhan Xaakinkeedu miyuusan xaq samayn doonin? 26
Markaasaa Rabbigu yidhi, Haddaan Sodom ka helo konton
qof oo xaq ah oo magaalada jooga, de markaas meeshaa
oo dhan waxaan ugu tudhi doonaa iyaga daraaddood. 27
Oo Ibraahimna wuu jawaabay oo yidhi, Bal eeg, waxaan
isu diray inaan Sayidka la hadlo, anoo ciid iyo dambas
ah. 28 Mindhaa kontonka xaqa ah shan baa ka dhiman;
miyaad magaalada oo dhan u baabbi'in hadday shanu ka
dhiman tahay? Markaasuu yidhi, Baabbi'in maayo haddaan
meeshaas shan iyo afartan ka helo. 29 Kolkaasuu mar
kale la hadlay, oo yidhi, Mindhaa waxaa halkaas laga heli
afartan. Markaasuu yidhi, Afartanka aawadood ayaanan u
baabbi'inayn. 30 Oo wuxuu yidhi, Sayidku yuusan cadhoon,
waan la hadlayaaye. Mindhaa waxaa halkaas laga heli
soddon. Markaasuu yidhi, Baabbi'in maayo haddaan soddon
halkaas ka helo. 31 Markaasuu yidhi, Bal eeg, waxaan isu
diray inaan Sayidka la hadlo: mindhaa waxaa halkaas laga
heli labaatan. Markaasuu yidhi, Labaatanka daraaddood
ayaanan u baabbi'inayn. 32 Oo wuxuu yidhi, Sayidku yuusan
cadhoon, oo weli waan la hadlayaaye, waase markan keliya.
Mindhaa waxaa halkaas laga heli toban. Wuxuuna yidhi,
Tobanka daraaddood ayaanan u baabbi'inayn. 33 Rabbiguna
wuu iska tegey markuu Ibraahim la dhammeeyey hadalkii,
Ibraahimna meeshiisii buu ku noqday.

19 Oo labadii malaa'igood baa Sodom fiidkii yimid; Luudna
wuxuu fadhiyey iridda Sodom. Oo markuu Luud iyagii
arkay ayuu u kacay inuu ka hor tago; wuuna sujuuday

oo wejigiisuu dhulka saaray; **2** oo wuxuu ku yidhi, Bal
eega, sayidyadaydiiyow, soo leexda, waan idin baryayaaye,
oo gala guriga addoonkiinna, oo caawa oo dhan jooga,
oo cagamaydha. Aroortii baanad kici doontaan oo iska
tegi doontaane. Oo waxay ku yidhaahdeen, Maya; laakiin
jidkaannu joogaynaa caawa oo dhan. **3** Aad buuna u
baryay; xaggiisayna u soo leexdeen, oo gurigiisii bay galeen;
diyaafad buuna u sameeyey, kibis aan khamiir lahaynna
wuu u dubay, wayna cuneen. **4** Laakiinse intaanay jiifsan
ka hor, waxaa gurigii hareereeyey nimankii magaalada, oo
ahaa nimankii Sodom, yar iyo weynba, dadkii oo dhan oo
ka yimid meel kastaba; **5** oo Luud bay u yeedheen, oo
waxay ku yidhaahdeen, Meeye nimankii caawa kuu yimid?
Dibadda noogu soo bixi iyaga, aannu fuulnee. **6** Oo Luudna
dibadduu ugu baxay iyagoo albaabka jooga, albaabkiina
wuu xidhay. **7** Oo wuxuu yidhi, Waan idin baryayaaye,
walaalahayow, ee wax sidaas u xun ha samaynina. **8** Bal
eega, waxaan leeyahay laba gabdhood oo aan weli nin u
tegin; haddaba waan idin baryayaaye, aan idiin soo bixiyo
iyaga, oo saad doontaan u gala, laakiin nimankan uun
waxba ha ku samaynina, maxaa yeelay, waxay soo hoos
galeen dugsiga saqafkayga. **9** Waxayna yidhaahdeen, Dib
u joogso. Oo waxay kaloo yidhaahdeen, Ninkanu socdaal
buu ku yimid, oo wuxuu doonayaa inuu xaakin noqdo.
Haatan wax daran baannu kugu samayn, intaannu iyaga
ku samayn lahayn in ka sii daran. Markaasay si xun ninkii
Luud ahaa u riixeen. Waxayna ugu soo dhowaadeen inay
albaabka jebiyaan. **10** Laakiinse nimankii baa gacmahoodii
soo bixiyey, oo Luud bay gurigii soo gashadeen, markaasay
albaabkii xidheen. **11** Wayna indho tireen nimankii guriga
albaabkiisa joogay, yar iyo weynba: oo saas daraaddeed
way ka daaleen inay albaabkii helaan. **12** Oo nimankii
waxay Luud ku yidhaahdeen, Intan mooyaane wax kale
ma ku leedahay meeshan? Wiil aad soddog u tahay iyo
wiilashaada iyo gabdhahaaga, iyo ku alla kaad magaalada
ku leedahay kala soo bax meeshan; **13** waayo, meeshan
waannu baabbi'in doonnaa, maxaa yeelay, qayladoodii baa
Rabbiga hortiisa aad ugu badatay: oo Rabbigu wuxuu noo
soo diray inaannu baabbi'inno. **14** Markaasuu Luud dibadda
u baxay, oo wuxuu la hadlay wiilashuu soddogga u ahaa,
oo gabdhihiisa qabay, oo wuxuu ku yidhi, Kaca, oo ka soo
baxa meeshan; waayo, Rabbigu magaalada wuu baabbi'in
doonaa. Laakiin wuxuu wiilashuu soddogga u ahaa ula
ekaaday sidii mid ku cayaaraya. **15** Oo markii waagii beryay
ayaa malaa'igihii Luud deddejiyeen, iyagoo leh, Kac, oo la
tag naagtaada iyo labadaada gabdhood oo halkan jooga;
waaba intaasoo aad dembiga magaalada ku baabba'daane.
**16** Laakiin markuu raagay ayay nimankii gacantiisa qabteen,
iyo gacantii naagtiisa, iyo gacantii labadiisii gabdhood;
Rabbiguna waa u naxariistay isaga, iyana way soo bixiyeen,
oo waxay geeyeen magaaladii dibaddeeda. **17** Oo markay
dibadda u soo bixiyeen ayuu ku yidhi, Naftaada la baxso;
gadaashaadana ha eegin. Bannaanka oo dhanna ha joogsan,
ee buurta u baxso, waaba intaas oo aad baabba'daaye. **18**
Luudna wuxuu ku yidhi iyagii, Sayidkaygiiyow, saas yaanay
noqon. **19** Bal eeg, anigoo addoonkaaga ah raalli baad iga
ahayd, oo waad weynaysay naxariistaadii aad i tustay markii
aad naftayda badbaadisay; aniguse buurta uma baxsan
karo, waaba intaasoo shar i gaadhaa oo aan dhintaa. **20**
Bal eeg, magaaladan baa dhow inaan u cararo, waana mid
yar, de iyada aan u baxsado, (miyaanay mid yar ahayn?)
naftayduna waa noolaan doontaa. **21** Oo wuxuu ku yidhi
isagii, Bal eeg, waxanna waan kaa aqbalay inaanan rogi
doonin magaaladii aad ka hadashay. **22** Dhaqso, oo halkaas
u baxso; waayo, waxba ma aan samayn karo ilaa aad
halkaas tagto. Sidaas daraaddeed magaalada magaceeda
waxaa loo bixiyey Socar. **23** Markii Luud Socar yimid ayaa
qorraxdu dhulka u soo baxday. **24** Markaasaa Rabbigu
wuxuu Sodom iyo Gomora ku soo daayay baruud iyo dab ka
yimid xagga Rabbiga oo samada ka soo daatay; **25** wuuna
rogay magaalooyinkaas, iyo Bannaankii oo dhan, iyo dadkii
degganaa magaalooyinkaas oo dhan, iyo wixii dhulka ka soo
baxay oo dhan. **26** Laakiinse naagtiisii oo daba socotay ayaa
dib u eegtay, waxayna noqotay tiir cusbo ah. **27** Ibraahimna
aroortii hore ayuu u kacay meeshii uu Rabbiga hor istaagay:
**28** oo wuxuu eegay xagga Sodom iyo Gomora, iyo dhulkii
Bannaanka oo dhan, wuuna fiiriyey, oo bal eeg, qiiqii dhulka
ayaa kor u baxay sidii qiiqa foornada oo kale. **29** Oo waxay
noqotay, markii Ilaah baabbi'iyey magaalooyinkii Bannaanka,
in Ilaah xusuustay Ibraahim, Luudna roggidda wuu ka bixiyey
markuu rogay magaalooyinkii Luud dhex degganaa. **30**
Luudna Socar wuu ka baxay, oo buurtuu degay, isaga iyo
labadiisii gabdhood ee la joogayba; waayo, wuu ka cabsaday
inuu Socar degganaado, wuxuuna degay bohol dhexdeed,
isaga iyo labadiisii gabdhood. **31** Oo tii curadda ahayd waxay
tii yarayd ku tidhi, Aabbeheen waa duq, dhulkana ma jiro
nin inoo iman kara sida caadada dunida oo dhan tahay. **32**
Kaalay, aynu aabbeheen khamri cabsiinnee, markaasaynu
la jiifsanaynaa, si aynu aabbeheen farcan ugala hadhno.
**33** Oo habeenkaasay aabbahood khamri cabsiiyeen, oo tii
curadda ahayd baa u tagtay oo la jiifsatay aabbeheed; mana
uu ogayn markay la jiifsatay, iyo markay ka kacday toona.
**34** Oo waxay noqotay in maalintii dambe ay tii curadda
ahayd ku tidhi tii yarayd, Bal eeg, xalayto aabbahay baan la

jiifsaday: caawana aynu khamri cabsiinno; oo adigu u tag oo
la jiifso isaga, aynu aabbeheen farcan kala hadhnee. **35** Oo
haddana habeenkaasay aabbahood khamri cabsiiyeen: oo
tii yarayd baa kacday oo aabbeheed la jiifsatay; mana uu
ogayn markay la jiifsatay iyo markay ka kacday toona. **36**
Oo sidaasay Luud labadiisii gabdhoodba aabbahood uurka
ugu lahaayeen. **37** Oo tii curaddii ahayd waxay dhashay
wiil, oo waxay magiciisii u bixisay Moo'aab, isna waa reer
Moo'aabka maanta joogo aabbahood. **38** Tii yarayd iyana
waxay dhashay wiil, oo waxay magiciisii u bixisay Bencammi:
isna waa reer Cammoonka maanta jooga aabbahood.

**20** Ibraahimna meeshaas wuu ka sodcaalay oo wuxuu
u kacay xagga dhulka Koonfureed, oo wuxuuna degay
Qaadeesh iyo Shuur dhexdooda, qariib ahaan buuna Geraar
u degay. **2** Ibraahimna wuxuu naagtiisii Saarah ka yidhi, Waa
walaashay. Oo Abimeleg oo ahaa boqorkii Geraar ayaa u soo
cid dirtay, oo watay Saarah. **3** Laakiinse Ilaah baa Abimeleg
habeenkii riyo ugu yimid, oo wuxuu ku yidhi, Bal eeg, waxaad
tahay meyd uun, waana naagtii aad qaadatay aawadeed,
maxaa yeelay, iyadu waa nin naagtiis. **4** Abimelegna uma
uusan dhowaan iyada, wuxuuna yidhi, Sayidow, miyaad
quruun xaq ah baabbi'inaysaa? **5** Miyuusan isaga qudhiisu
igu odhan, Waa walaashay? Oo iyana xataa waxay igu
tidhi, Isagu waa walaalkay. Tan waxaan ku sameeyey
daacadnimada qalbigayga iyo daahirsanaanta gacmahayga.
**6** Oo Ilaah wuxuu ku yidhi isaga intuu riyoonayay, Haah,
waan ogahay inaad waxan daacadnimada qalbigaaga ku
samaysay, anna waan kaa celiyey inaad igu dembaabto:
sidaas daraaddeed kuuma aan oggolaan inaad iyada taabato.
**7** Haddaba ninka naagtiisa u celi, waayo, isagu waa nebi,
wuuna kuu ducayn doonaa, waanad noolaan doontaa.
Haddaadan iyada celinna, ogow hubaal waad dhiman
doontaa, adiga iyo waxaaga oo dhammuba. **8** Abimelegna
aroor horuu kacay, oo wuxuu u yeedhay addoommadiisii oo
dhan, oo waxyaalahan oo dhan buu u sheegay, nimankiina
aad iyo aad bay u cabsadeen. **9** Markaasaa Abimeleg
wuxuu u yeedhay Ibraahim, oo wuxuu ku yidhi, Waa maxay
waxa aad nagu samaysay? Oo maxaan kuugu dembaabay,
oo aad aniga iyo boqortooyadaydaba dembi weyn ugu
soo jiidday? Waxaad igu samaysay waxyaalo aan waajib
ahayn in la sameeyo. **10** Abimelegna wuxuu Ibraahim ku
yidhi, Maxaad aragtay oo aad waxan u samaysay? **11**
Ibraahimna wuxuu yidhi, Waxaan mooday inaan cabsida Ilaah
meeshan jirin, oo ay naagtayda aawadeed ii dili doonaan.
**12** Oo weliba sida runta ah iyadu waa walaashay, waana
gabadhii aabbahay, laakiin ma aha gabadhii hooyaday;
waxayna noqotay naagtaydii. **13** Waxaana dhacay, markii
Ilaah iga wareejiyey gurigii aabbahay, inaan ku idhi iyada,
Raxmaddaada aad i tusi doonto waxay tahay inaad meel
kastoo aynu tagnaba iga tidhaahdo, Waa walaalkay. **14**
Markaasaa Abimeleg wuxuu waday ido iyo dibiyo, iyo niman
addoommo ah, iyo naago addoommo ah, oo wuxuu siiyey
Ibraahim, naagtiisii Saarahna wuu u celiyey. **15** Abimelegna
wuxuu ku yidhi, Bal eeg dhulkaygu waa ku hor yaallaaye.
Meeshaad doonto deg. **16** Saarahna wuxuu ku yidhi, Bal
eeg, walaalkaa waxaan siiyey kun xabbadood oo lacag
ah, waana u indhadabool kuwa kula jooga oo dhan; oo
xagga wax kasta waa lagaa xaq mariyey. **17** Ibraahimna
Ilaah buu baryay, markaasaa Ilaah bogsiiyey Abimeleg,
iyo naagtiisii, iyo gabdhihii midiidinyada u ahaa; waxayna
dhaleen carruur. **18** Waayo, Ilaah wuxuu awday maxalladii
kuwa reerka Abimeleg oo dhan, waana Saarah oo ahayd
naagtii Ibraahim aawadeed.

**21** Oo Rabbigu Saarah wuu soo booqday siduu yidhi, oo
Rabbigu wuxuu Saarah u yeelay siduu kula hadlay. **2**
Oo Saarah way uuraysatay, oo Ibraahim wiil bay u dhashay
isagoo da' weyn, waxayna ahayd wakhtigii Ilaah kala hadlay
isaga. **3** Oo Ibraahim wuxuu wiilkiisii u dhashay, oo Saarah u
dhashay isaga, u bixiyey Isxaaq. **4** Oo Ibraahim baa guday
wiilkiisii Isxaaq markuu siddeed maalmood jiray, sidii Ilaah ku
amray isaga. **5** Oo Ibraahimna wuxuu jiray boqol sannadood,
markii wiilkiisii Isxaaq u dhashay isaga. **6** Saarahna waxay
tidhi, Ilaah waa iga qosliyey, qof kasta oo maqlaana waa
ila qosli doonaa. **7** Oo waxay tidhi, Yaa Ibraahim ku odhan
lahaa, Saarah carruur bay nuujin doontaa? Waayo, wiil
baan u dhalay isaga oo da' weyn. **8** Wiilkiina wuu koray,
naaskiina waa laga gudhiyey. Ibraahimna diyaafad weyn
buu sameeyey maalintii Isxaaq naaska laga gudhiyey. **9**
Saarahna waxay aragtay wiilkii ay Haagaar tii Masriyadda
ahayd Ibraahim u dhashay oo ku cayaaraya. **10** Sidaas
daraaddeed waxay Ibraahim ku tidhi, Eri addoontan iyo
wiilkeedaba: maxaa yeelay, wiilka addoontanu wax la dhaxli
maayo wiilkayga Isxaaq ah. **11** Waxaasuna Ibraahim aad
buu ula xumaa xagga wiilkiisa. **12** Ilaahna wuxuu Ibraahim
ku yidhi, Yaanay kula xumaan wiilka dartiis, iyo naagta
addoonta ah toona. Wax alla wixii Saarah kugu tidhaahdo,
hadalkeeda maqal; waayo, farcankaaga Isxaaq baa loogu
yeedhi doonaa. **13** Wiilka addoontana waxaan ka dhigi
doonaa quruun, waayo, isna waa farcankaaga. **14** Ibraahimna
aroortii horuu kacay, wuxuuna qaaday cunto iyo sibraar
biyo ah, oo Haagaar buu siiyey intuu garbaha u saaray,
wiilkiina wuu siiyey, markaasuu eryay: wayna iska tagtay,

oo ku wareegtay cidladii Bi'ir Shebac. 15 Biyihii sibraarka
ku jirayna way dhammaadeen, kolkaasay ilmihii ku xoortay
geedihii midkood hoostiisa. 16 Wayna tagtay oo waxay
fadhiisatay meel ku soo jeedda oo ka fog, oo qiyaastii ah
intii fallaadh la ganay gaadho, waxayna tidhi, Yaanan eegin
dhimashada wiilka. Iyadoo fadhida meel ku soo jeedda ayay
codkeedii kor u qaadday oo ooyday. 17 Ilaah baana maqlay
codkii wiilka; malaa'igtii Ilaahna Haagaar bay samada uga
yeedhay, oo waxay ku tidhi, Haagaaray, maxaa ku helay?
Ha baqin; waayo, Ilaah waa maqlay codkii wiilka, meeshuu
joogo isagu. 18 Kac oo wiilka toosi, oo gacantaada ku hay;
maxaa yeelay, quruun weyn baan ka dhigi doonaa isaga. 19
Markaasaa Ilaah indhaheedii furay, oo waxay aragtay ceel
biyo ah; kolkaasay tagtay, oo sibraarkii biyo ka soo buuxisay,
oo wiilkii waraabisay. 20 Ilaahna wiilkii buu la jiray; wuuna
koray; oo cidladuu degay, wuxuuna noqday qaansoole. 21
Wuxuuna degay cidladii Faaraan: hooyadiis baana dhulka
Masar naag uga qaadday. 22 Waxayna noqotay wakhtigaas
in Abimeleg iyo Fiikol oo ahaa madaxda ciidankiisa ay
la hadleen Ibraahim iyagoo leh, Ilaah waa kugula jiraa
waxa aad samayso oo dhan. 23 Haddaba halkan Ilaah
iigu dhaaro inaadan i khiyaanaynin aniga ama wiilkayga,
ama wiilkayga wiilkiisa, laakiinse sidii aan wanaagga kuugu
sameeyey, inaad adna iigu samaynaysid, aniga iyo dhulka
aad qariib ahaanta u degganaydba. 24 Ibraahimna wuxuu
yidhi, Waan kuu dhaaran doonaa. 25 Ibraahimse wuxuu
Abimeleg u canaantay ceelkii ay addoommada Abimeleg
ka xoogeen aawadiis. 26 Abimelegna wuxuu yidhi, Anigu
garan maayo ka waxaas sameeyey; adna iima aad sheegin,
welina ma aan maqlin, maanta mooyaane. 27 Markaasaa
Ibraahim ido iyo dibiyo kaxeeyey, oo wuxuu siiyey Abimeleg;
labadoodiina axdi bay dhigteen. 28 Kolkaasaa Ibraahim
idihii gooni ahaan uga bixiyey toddoba sabeenood. 29
Abimelegna wuxuu Ibraahim ku yidhi, Micnehoodu waa
maxay toddobadan sabeenood oo aad gooni ahaantooda
u bixisay? 30 Markaasuu yidhi, Toddobadan sabeenood
waa inaad iga guddoontid inay markhaati ii noqoto inaan
anigu ceelkan qoday. 31 Sidaas daraaddeed meeshaas
wuxuu u bixiyey Bi'ir Shebac; maxaa yeelay, labadooduba
meeshaas bay ku dhaarteen. 32 Sidaas daraaddeed axdi
bay ku dhigteen Bi'ir Shebac; markaasaa Abimeleg kacay,
isaga iyo Fiikol oo ahaa madaxda ciidankiisa, oo waxay ku
noqdeen dhulkii reer Falastiin. 33 Ibraahimna geed buu Bi'ir
Shebac ku beeray, oo halkaas buu ku ducaystay magaca
Rabbiga Ilaaha daa'imka ah. 34 Ibraahimna maalmo badan
ayuu dhulka reer Falastiin qariib ahaan ku degganaa.

**22** Oo waxaa dhacay waxyaalahaas ka dib, in Ilaah
tijaabiyey Ibraahim, oo uu ku yidhi, Ibraahimow. Isna
wuxuu yidhi, Waa i kan. 2 Markaasuu ku yidhi, Hadda
kaxee wiilkaaga keligiis ah, kan aad jeceshahay, oo ah
Isxaaq, oo u kac dalka Moriyaah; oo halkaas isaga sida
allabari la gubo ku dul bixi buuraha middood oo aan kuu
sheegi doono. 3 Oo aroortii horaa Ibraahim kacay, oo
wuxuu kooraystay dameerkiisii, oo wuxuu kaxaystay laba
ka mid ah dhallinyaradiisii, iyo wiilkiisii Isxaaq; qoryihiina
allabariga la gubo wuu u jeexjeexay, wuuna kacay, oo wuxuu
tegey meeshii Ilaah u sheegay. 4 Maalintii saddexaad ayuu
Ibraahim indhihiisa kor u taagay, markaasuu meeshii oo
ka fog arkay. 5 Ibraahimna wuxuu raggiisii dhallinyarada
ahaa ku yidhi, Idinku halkan dameerka la jooga, aniga
iyo wiilkuna halkoo baannu tegaynaa oo Ilaah ku soo
caabudaynaa, dabadeedna waannu idinku soo noqonaynaa.
6 Ibraahimna wuxuu qaaday qoryihii allabariga la gubo,
oo wuxuu saaray wiilkiisii Isxaaq, isna wuxuu gacantiisa
ku qaaday dabkii iyo mindidii; markaasay labadoodiiba
israaceen. 7 Isxaaqna waa la hadlay aabbihiis Ibraahim, oo
yidhi, Aabbow. Isna wuxuu yidhi, Waa i kan, wiilkaygiiyow.
Markaasuu ku yidhi, Bal eeg, waa kuwan dabkii iyo qoryihii,
laakiinse meeh wankii allabariga la gubo loo bixin lahaa?
8 Ibraahimna wuxuu yidhi, Ilaah qudhiisaa keeni doona
wankii allabariga la gubo loo bixin lahaa, wiilkaygiiyow;
saas daraaddeed labadoodiiba way israaceen. 9 Oo waxay
yimaadeen meeshii Ilaah isaga u sheegay; Ibraahimna
meeshaasuu ka dhisay meeshii allabariga, qoryihiina wuu
hagaajiyey, markaasuu xidhay wiilkiisii Isxaaq, oo meeshii
allabariga saaray qoryihii dushooda. 10 Ibraahimna gacantiisii
buu fidiyey, oo mindidii buu u qaaday inuu wiilkiisii dilo. 11
Markaasay malaa'igtii Rabbigu samada uga yeedhay isaga,
oo waxay ku tidhi, Ibraahimow, Ibraahimow. Kolkaasuu
yidhi, Waa i kan. 12 Markaasay ku tidhi, Gacantaada ha
saarin wiilka, waxbana ha ku samaynin: waayo, hadda waan
garanayaa inaad Ilaah ka cabsatid, maxaa yeelay, igama
aadan lexejeclaysan wiilkaaga, kaas oo ahaa wiilkaaga
keligiis ah. 13 Markaasaa Ibraahim indhihiisii kor u taagay, oo
wax fiiriyey, oo wuxuu dabadiisa ku arkay wan geesaha kayn
kula jira. Markaasaa Ibraahim tegey oo wankii soo kaxeeyey,
oo wuxuu u bixiyey allabari guban meeshii wiilkiisa. 14
Ibraahimna meeshaas wuxuu u bixiyey Yehowah Yireh;
xataa ilaa maanta waxaa la yidhaahdaa, Buurta Rabbiga
ayaa lagu arki doonaa. 15 Kolkaasaa mar labaad malaa'igtii
Rabbigu Ibraahim samada uga yeedhay, 16 oo waxay ku
tidhi, Rabbigu wuxuu yidhi, Waxan aad samaysay aawadood,
iyo wiilkaaga aadan iga lexejeclaysan, kaas oo ah wiilkaaga

keligiis ah aawadiis ayaan nafsaddayda ku dhaartay 17
inaan barako ku barakayn doono, oo aan farcankaaga u
tarmin doono sida xiddigaha cirka, iyo sida cammuudda
taal badda xeebteeda; oo uu farcankaaguna hantiyi doono
cadaawayaashiisa iriddooda; 18 oo ay quruumaha dunida oo
dhammu ku barakoobi doonaan farcankaaga, maxaa yeelay,
codkaygaad addeecday. 19 Haddaba Ibraahim wuxuu ku
noqday raggiisii dhallinyarada ahaa, markaasay kaceen oo
waxay wada tageen Bi'ir Shebac, Ibraahimna wuxuu iska
degay Bi'ir Shebac. 20 Oo waxaa dhacay waxyaalahaas
dabadood, in Ibraahim loo sheegay, oo lagu yidhi, Bal eeg,
Milkah carruur bay u dhashay walaalkaa Naaxoor. 21 Waxay
yihiin Cuus oo ah curadkiisa, iyo Buus oo ah walaalkiis,
iyo Qemuu'el oo ah Araam aabbihiis; 22 iyo Kesed, iyo
Haso, iyo Fildash, iyo Yidlaf iyo Betuu'el. 23 Betuu'elna
wuxuu dhalay Rebeqah. Siddeeddan bay Milkah u dhashay
Naaxoor, oo ahaa Ibraahim walaalkiis. 24 Addoontiisii la
odhan jiray Re'uumah waxay iyana u dhashay Tebah, iyo
Gaham, iyo Tahash, iyo Macakah.

**23** Saarah waxay noolayd boqol iyo toddoba iyo labaatan
sannadood; intaasu waa Saarah cimrigeedii. 2 Oo
Saarah waxay ku dhimatay Qiryad Arbac, taasoo ah Xebroon,
tan ku taal dalka Kancaan: Ibraahimna wuxuu u yimid inuu
u baroorto, oo uu u ooyo Saarah. 3 Markaasaa Ibraahim
meydkii naagtiisa ka kacay, oo wuxuu la hadlay reer Xeed,
isagoo ku leh, 4 Waxaan ahay shisheeye sodcaal ah oo idin
dhex jooga: ee dhexdiinna iga siiya meel xabaaleed oo hanti
ah, si aan meydka naagtayda hortayda uga aaso. 5 Oo reer
Xeedna Ibraahim bay u jawaabeen, iyagoo ku leh, 6 Bal na
maqal sayidkaygiiyow, adigu dhexdayada waxaad ku tahay
amiir weyn. Midka ugu wanaagsan qabriyadayada meydka
naagtaada ku aas. 7 Midkayana kaama lexejeclaysan doono
qabrigiisa inaad ku aastid meydka naagtaada. Markaasaa
Ibraahim sare kacay, oo uu u sujuuday dadkii waddanka
lahaa, oo ahaa reer Xeed. 8 Wuuna la hadlay oo ku yidhi,
Haddaad oggoshihiin inaan meydka naagtayda hortayda
ka aaso, i maqla oo ii barya Cefroon ina Sohar, 9 inuu i
siiyo godka la yidhaahdo Makfelah oo uu haysto, oo ku
yaal berrinkiisa geestiisa. Qiimo dhan ha iga siiyo, inay
dhexdiinna ii noqoto meel xabaaleed oo hanti ah. 10 Haddaba
Cefroon wuxuu fadhiyey reer Xeed dhexdooda; oo Cefroon
oo ahaa reer Xeed ayaa Ibraahim u jawaabay, iyadoo ay
maqlayaan reer Xeed intii iriddii magaaladiisa ka gashay oo
dhammu, oo wuxuu ku yidhi, 11 Maya, sayidkaygiiyow, i
maqal, berrinka waan ku siinayaa, godka ku dhex yaalna
waan ku siinayaa; waxaan kugu siinayaa ragga reerkayga
hortooda, ee meydka ku aaso. 12 Ibraahimna wuxuu ku
hor sujuuday dadkii waddanka. 13 Markaasuu Cefroon la
hadlay iyadoo ay dadkii waddanku maqlayaan, oo wuxuu
ku yidhi, Waan ku baryayaaye, haddaad oggoshahay i
maqal; waan ku siin qiimihii berrinka ee iga qaado, anna
meydkaan meeshaas ku aasan. 14 Cefroonna Ibraahim buu
u jawaabay, isagoo ku leh, 15 Sayidkaygiiyow, bal i maqal:
meel dhul ah oo qiimihiisu yahay afar boqol oo sheqel oo
lacag ah, waa maxay dhexdeenna? Haddaba meydka aaso.
16 Ibraahimna Cefroon buu maqlay; markaasaa Ibraahim u
miisaamay Cefroon lacagtii uu u sheegay, iyadoo ay reer
Xeed maqlayaan, oo waxay ahayd, afar boqol oo sheqel oo
lacag ah, oo lacagtii baayacmushtarka ku socotay ah. 17
Sidaasaa berrinkii Cefroon, oo Makfelah ku yiil, oo Mamre
ku hor yiil, berrinkii iyo godkii ku dhex yiil, iyo geedihii
ku yiil berrinkii, iyo xuduudkii ku wareegsanaa oo dhanba
waxaa lagu xaqiijiyey 18 reer Xeed intii iriddii magaaladiisa
ka gashay oo dhan hortooda, in Ibraahim hanti ahaan u
lahaado. 19 Markaas ka dib ayaa Ibraahim naagtiisii Saarah
ku aasay godkii berrinkii Makfelah oo ku hor yiil Mamre, taas
oo ah Xebroon oo dalka Kancaan ku tiil. 20 Oo berrinkii iyo
godkii ku dhex yiilba reer Xeed ayaa Ibraahim u xaqiijiyey
inay meel xabaaleed oo hanti ah u noqdaan.

**24** Ibraahimna waa da' weynaa, gabow buuna la dhacay.
Rabbiguna Ibraahim buu ku barakeeyey wax walba. 2
Oo Ibraahim, wuxuu ku yidhi addoonkiisii oo dadka gurigiisa
ugu weynaa, oo u talin jiray wixii uu lahaa oo dhan, Waan
ku baryayaaye gacantaada bowdadayda hoos dhig. 3 Oo
waxaan kugu dhaarin doonaa Rabbiga ah Ilaaha samada
iyo Ilaaha dhulka inaadan wiilkayga naag uga guurinayn
gabdhaha reer Kancaanka aan dhex degganahay: 4 laakiin
waxaad u kacdaa dalkaygii iyo xigaalkaygii, oo waxaad naag
uga keentaa wiilkayga Isxaaq. 5 Addoonkiina wuxuu ku
yidhi, Waxaa laga yaabaa inaanay naagtu oggolaan inay
ii soo raacdo dalkan; ma inaan wiilkaaga ku celiyo dalkii
aad ka timid baa? 6 Ibraahimna wuxuu ku yidhi isagii, Iska
jir oo wiilkayga meeshaas ha ku celin. 7 Rabbiga Ilaaha
samada ah, oo iga soo kaxeeyey gurigii aabbahay iyo
dalkaygii aan ku dhashay, oo ila hadlay, iiguna dhaartay,
isagoo leh, Farcankaaga ayaan dalkan siinayaa, ayaa
malaa'igtiisa kaa sii hor diri doona, wiilkaygana naag baad
halkaas uga soo guurin doontaa. 8 Haddii naagtu aanay
oggolaan inay ku soo raacdo, markaas dhaartaydan waxba
kaa ma saarna, laakiin wiilkayga halkaas ha ku celin. 9
Addoonkii wuxuu gacantiisii hoos dhigay bowdadii sayidkiisii
Ibraahim, wuxuuna ugu dhaartay wax arrintan ku saabsan.
10 Addoonkiina wuxuu kaxeeyey toban awr, oo ka mid ah

awrtii sayidkiisa, wuuna tegey, isagoo gacantiisa ku haya
waxyaalihii sayidkiisa oo wanaagsanaa oo dhan, oo intuu
kacay ayuu tegey Mesobotamiya, xagga magaalada Naaxoor.
11 Awrtiina wuxuu tu'iyey meel magaalada dibaddeeda ah
oo ceelka biyaha agtiisa ah kolkay galabtii ahayd, marka
dumarku biyo dhaansiga u soo baxaan. 12 Oo wuxuu
yidhi, Rabbiyow, sayidkayga Ibraahim Ilaahiisow, waan ku
baryayaaye, maanta i liibaani, sayidkayga Ibraahimna u
roonow. 13 Bal eeg, waxaan ag taaganahay isha biyaha
ah, gabdhaha dadka magaaladuna waxay u soo baxayaan
inay biyo dhaansadaan. 14 Gabadhii aan ku odhan doono,
Ashuunkaaga deji, waan ku baryayaaye, aan ka cabbee,
oo igu odhan doonta, Cab, awrtaadana waan waraabin
doonaa, taasu ha noqoto tii aad u dooratay addoonkaaga
Isxaaq, oo taas baan ku ogaan doonaa inaad sayidkayga
u roonaatay. 15 Intuusan hadalkii dhammayn, waxaa soo
baxday, iyadoo ashuunkeedii garabka ku sidata, Rebeqah
oo u dhalatay Betuu'el wiilkii Milkah, oo ahayd naagtii
Naaxoorkii ahaa Ibraahim walaalkiis. 16 Gabadhuna waa
suurad quruxsanayd, waxayna ahayd bikrad aan ninna
u tegin. Waxay tagtay ishii biyaha ahayd xaggeeda, oo
intay ashuunkeedii soo buuxsatay, ayay soo baxday. 17
Markaasuu addoonkii ku orday inuu ka hor tago oo wuxuu
ku yidhi, Ashuunkaaga iga waraabi in yar oo biyo ah, waan
ku baryayaaye. 18 Markaasay tidhi, Cab, sayidkaygiiyow. Oo
intay dhaqsatay ayay ashuunkeedii dejisay oo gacanta ku
qabatay, wayna waraabisay. 19 Oo markii ay waraabisay ka
dib ayay ku tidhi, Awrtaadana waan u dhaamin doonaa, ilaa
ay wabxaan. 20 Oo intay dhaqsatay ayay biyihii ashuunkeedii
ku shubtay berkeddii, oo mar kalay ceelkii ku orodday inay
soo dhaamiso, wayna u dhaamisay awrtiisii oo dhan. 21
Ninkiina aad buu u fiiriyey iyada, isagoo aamusan, inuu
ogaado in Rabbigu ku liibaaniyey sodcaalkiisii iyo in kale. 22
Markii awrtii cabtay ka dib ayaa ninkii soo qaaday sangelis
dahab ah oo miisaankiisu yahay nus sheqel, gacmaheedana
wuxuu u soo qaaday laba dugaagadood oo dahab ah oo
miisaankoodu yahay toban sheqel. 23 Oo wuxuu ku yidhi,
Ina ayaad tahay? Waan ku baryayaaye, ii sheeg. Guriga
aabbahaa meel aannu ku hoyanno ma leeyahay? 24 Oo
waxay ku tidhi isagii, Anigu waxaan ahay ina Betuu'el, wiilkii
Milkah ay Naaxoor u dhashay. 25 Oo weliba waxa kale oo ay
ku tidhi, Caws iyo cunto badanba waannu haysannaa, iyo
meel lagu hoydo. 26 Markaasaa ninkii madaxa foororiyey
oo Rabbiga caabuday. 27 Markaasuu yidhi, Mahad waxaa
leh Rabbiga ah sayidkayga Ibraahim Ilaahiisa, oo aan
naxariistiisa iyo runtiisa ka joojin sayidkayga. Anigana
Rabbigu jidkuu igu soo hoggaamiyey, oo wuxuu i keenay
gurigii sayidkayga walaalihiis. 28 Gabadhiina intay orodday
ayay waxyaalahan dadkii guriga hooyadeed uga warrantay.
29 Rebeqahna waxay lahayd walaal magiciisa la yidhaahdo
Laabaan. Markaasaa Laabaan dibadda u baxay oo wuxuu
ku orday ninkii isha joogay. 30 Markuu arkay sangeliskii,
iyo dugaagadihii gacmihii walaashiis ku jiray, oo uu maqlay
hadalkii walaashiis Rebeqah, iyadoo leh, Sidan buu ninkii iila
hadlay, ayuu u yimid ninkii oo bal eeg, wuxuu ag istaagay
awrtii isha joogtay. 31 Oo wuxuu ku yidhi, Kaaga Rabbigu
barakeeyeyow, soo gal, maxaad dibadda u taagan tahay?
Gurigii waan soo hagaajiyey, awrtana meel baan u diyaariyey.
32 Ninkiina gurigii buu soo galay, awrtiina wuu furay, wuxuuna
isaga awrtii ugu dhiibay caws iyo cunto, biyona wuu siiyey
inay ku cago maydhaan isaga iyo raggii la socdayba. 33
Cuntona waa la hor dhigay inuu cuno: laakiinse wuxuu
yidhi, Cuni maayo ilaa aan sheego farriintayda. Kolkaasuu
yidhi, Sheeg. 34 Markaasuu yidhi, Waxaan ahay Ibraahim
addoonkiisa. 35 Rabbigu aad iyo aad buu u barakeeyey
sayidkayga, wuuna weynaaday: wuxuuna siiyey adhi iyo
lo', iyo lacag iyo dahab, iyo rag addoommo ah, iyo naago
addoommo ah, iyo geel iyo dameerro. 36 Saarah oo ahayd
sayidkayga naagtiisii ayaa wiil u dhashay sayidkayga markay
gabowday, oo wuxuu isaga siiyey wuxuu leeyahay oo dhan.
37 Sayidkayguna wuu i dhaariyey, isagoo leh, Wiilkayga waa
inaanad naag uga guurin gabdhaha reer Kancaanka aan
dalkooda degganahay. 38 Laakiinse waxaad u kacdaa gurigii
aabbahay, iyo xigaalkaygii, oo wiilkayga naag uga keen. 39
Markaasaan sayidkaygii ku idhi, Waxaa laga yaabaa inaanay
naagtu i soo raaci doonin. 40 Oo wuxuu igu yidhi, Rabbiga
aan hortiisa ku socdo wuxuu ku raacin doonaa malaa'igtiisa,
jidkaagana wuu kugu liibaanin doonaa, wiilkaygana naag
baad uga guurin doontaa xigaalkaygii iyo gurigii aabbahay,
41 dabadeedna dhaartayda waxba kaama saarna, markaad u
tagto xigaalkay; oo hadday iyada ku siin waayaan, markaas
dhaartayda waxba kaama saarna. 42 Maantaan isha imid
oo waxaan idhi, Rabbiyow, sayidkayga Ibraahim Ilaahiisow,
haddaad haatan jidkayga aan ku socdo igu liibaanisid, 43 bal
eeg, waxaan ag taaganahay isha biyaha ah, gabadhii u soo
baxda inay biyo dhaansato oo aan ku odhan doono, Waan
ku baryayaaye, ashuunkaaga iga sii in yar oo biyo ah aan
cabbee, 44 oo igu odhan doonta, Cab, awrtaadana waan u
dhaamin doonaa, taasu ha noqoto tii Rabbigu u doortay
wiilka sayidkayga. 45 Oo intaan hadalkii qalbigayga ka
dhammaan ayaa Rebeqah soo baxday iyadoo ashuunkeedii
garabka ku sidata, markaasay ishii ku dhaadhacday, oo soo
dhaansatay: anna waxaan ku idhi, Waan ku baryayaaye,
i waraabi. 46 Iyana intay dhaqsatay oo ay ashuunkeedii

garabkeeda ka soo dejisay ayay tidhi, Cab, awrtaadana waan
waraabin doonaa: sidaas daraaddeed waan cabbay, awrtiina
way waraabisay. 47 Markaasaan weyddiiyey oo ku idhi, Ina
ayaad tahay? Oo waxay tidhi, Ina Betuu'el wiilkii Naaxoor ay
Milkah u dhashay isaga. Markaasaan sangeliskii sanka u
sudhay; dugaagadihiina gacmaha u geliyey. 48 Kolkaasaan
madaxa fooro0riyey, oo Rabbiga caabuday, oo waxaan
ammaanay Rabbiga ah sayidkayga Ibraahim Ilaahiisa,
oo igu soo hoggaamiyey jidkii toosnaa, inaan gabadhii
sayidkayga walaalkiis u kaxeeyo wiilkiisa. 49 Haddaba
haddaad sayidkayga ula macaamiloonaysaan si raxmad leh
oo daacad ah, ii sheega: haddii kalese ii sheega, inaan u
leexdo xagga midigta ama xagga bidixda. 50 Markaasay
Laabaan iyo Betuu'el jawaabeen oo yidhaahdeen, Waxanu
wuxuu ka soo baxay xagga Rabbiga, annana kugulama hadli
karno xumaan iyo samaan toona. 51 Bal eeg, Rebeqah waa
ku hor joogtaaye, kaxee oo la tag, oo ha noqoto sayidkaaga
wiilkiisii naagtiisa, sidii Rabbigu ku hadlay. 52 Markii uu
Ibraahim addoonkiisii hadalkoodii maqlay ayuu Rabbiga u
sujuuday. 53 Markaasuu addoonkii soo bixiyey jowharro
lacag ah iyo jowharro dahab ah, iyo dhar, oo Rebeqah siiyey:
walaalkeed iyo hooyadeedna wuxuu siiyey waxyaalo qaali
ah. 54 Markaasay wax cuneen oo wax cabbeen, isaga iyo
raggii la jirayba, habeenkii oo dhanna halkaasay joogeen.
Aroortii bay kaceen oo wuxuu yidhi, Xagga sayidkaygii ii
dira. 55 Walaalkeed iyo hooyadeedna waxay yidhaahdeen,
Gabadhu ha nala joogto dhawr maalmood, ugu yaraan
toban beri; dabadeedna way tegi doontaa. 56 Markaasuu ku
yidhi iyagii, Rabbigu waa igu liibaaniyey jidkaygii, sidaas
daraaddeed ha i raajinina, ee i dira inaan sayidkaygii u tago.
57 Markaasay yidhaahdeen, Gabadha waannu u yeedhi
doonnaa oo weyddiin doonnaa. 58 Markaasay Rebeqah u
yeedheen, oo waxay ku yidhaahdeen, Ninkan ma raacaysaa?
Oo waxay tidhi, Haah, waan raacayaa. 59 Markaasay
walaashood Rebeqah direen, iyada iyo midiidinteedii, iyo
addoonkii Ibraahim, iyo raggiisiiba. 60 Oo Rebeqah bay u
duceeyeen oo ku yidhaahdeen, Walaashayoy, kumanyaal
kun hooyadood noqo, farcankaaguna kuwa iyaga neceb
iriddooda ha hantiyeen. 61 Rebeqahna way kacday, iyada
iyo gabdhaheediiba, oo waxay fuuleen awrtii, ninkiina way
raaceen: addoonkiina wuu kaxeeyey Rebeqah, wuuna tegey.
62 Isxaaqna wuxuu ka yimid xagga jidka Bi'ir Lahayroy, waayo,
wuxuu degganaa dhulka Koonfureed. 63 Oo gabbaldhicii
ayaa Isxaaq berrinka u soo baxay inuu fikiro: markaasuu
indhihiisa kor u taagay, oo wax fiiriyey, oo wuxuu arkay awr
soo socota. 64 Rebeqahna indhaheedii bay kor u taagtay,
oo markay Isxaaq aragtay ayay ratigii ka degtay. 65 Oo
waxay addoonkii ku tidhi, Waa ayo ninkaas berrinka dhex
socda, oo inaga hor imanaya? Addoonkiina wuxuu yidhi,
Waa sayidkaygii. Markaasay indhashareerteedii qaadatay oo
hagoogatay. 66 Addoonkiina wuxuu Isxaaq u sheegay wixii
uu sameeyey oo dhan. 67 Isxaaqna wuxuu iyadii soo geliyey
teendhadii hooyadiis Saarah, Rebeqahna wuu guursaday,
oo naagtiisii bay noqotay. Wuuna jeclaaday iyada, oo Isxaaq
waxaa laga qalbi qabowjiyey geeridii hooyadiis.

**25** Ibraahim wuxuu guursaday naag kale, magaceeduna
wuxuu ahaa Qetuurah. 2 Oo waxay u dhashay Simraan,
iyo Yoqshaan, iyo Medaan, iyo Midyaan, iyo Yishbaaq,
iyo Shuu'ah. 3 Yoqshaanna wuxuu dhalay Shebaa, iyo
Dedaan. Wiilashii Dedaanna waxay ahaayeen Ashuurim,
iyo Letushim, iyo Le'ummiim. 4 Wiilashii Midyaanna waxay
ahaayeen Ceefah, iyo Ceefer, iyo Xanoog, iyo Abiidac iyo
Eldacah. Kuwanu waxay wada ahaayeen carruurtii Qetuurah.
5 Ibraahimna wax alla wuxuu lahaa wuxuu siiyey Isxaaq. 6
Laakiinse naagihii addoommada ahaa oo Ibraahim haystay
wuxuu wiilashoodii siiyey hadiyado, oo intuu isagu noolaa
ayuu ka diray wiilkiisii Isxaaq, bari buuna u diray xagga dhulka
bari. 7 Sannadihii Ibraahim noolaa oo cimrigiisu ahaa waa
boqol iyo shan iyo toddobaatan sannadood. 8 Ibraahimna
waa naf baxay, cimri wanaagsan buuna ku dhintay, isagoo
duq ah, oo sannado badan jiray; oo wuxuu ku darmaday
dadkiisii. 9 Markaasay wiilashiisii Isxaaq iyo Ismaaciil ku
aaseen godkii Makfelah, oo ku dhex yiil berrinkii Cefroon ina
Sohar oo ahaa reer Xeed oo ku hor yiil Mamre; 10 berrinkaas
oo ahaa kii Ibraahim ka iibsaday reer Xeed. Halkaasaa
lagu aasay Ibraahim iyo naagtiisii Saarahba. 11 Ibraahim
geeridiisii ka dib ayaa Ilaah barakeeyey wiilkiisii Isxaaq;
Isxaaqna wuxuu ag degganaa Bi'ir Lahayroy. 12 Haddaba
kuwanu waa farcankii Ismaaciil ina Ibraahim, kii Haagaar
tii Masriyadda ahayd oo Saarah midiidinteedii ahayd ay u
dhashay Ibraahim. 13 Kuwanuna waa magacyadii wiilashii
Ismaaciil, magacyadoodii sidii farcankoodii ahaa. Curadkii
Ismaaciil wuxuu ahaa Nebayod; waxaana ku xigay Qedaar,
iyo Adbe'el, iyo Mibsam, 14 iyo Mishmaac, iyo Duumah,
iyo Masa; 15 Hadar, iyo Tema, iyo Yetuur, iyo Nafish, iyo
Qedemah. 16 Kuwanu waa wiilashii Ismaaciil, kuwanuna
waa magacyadoodii sidii ay tuulooyinkoodii iyo xeryahoodii
ahaayeen; waxayna lahaayeen laba iyo toban amiir sidii ay
qolooyinkoodii ahaayeen. 17 Sannadihii Ismaaciil noolaa
waa boqol iyo toddoba iyo soddon sannadood, wuuna
naf baxay, oo dhintay; wuxuuna ku darmaday dadkiisii.
18 Waxayna degganaayeen tan iyo Xawiilaah iyo Shuur
tan ku hor taal Masar, haddaad u kacdo xagga Ashuur.

Walaalihiis oo dhan hortooda ayuu degay. 19 Kuwanuna waa
farcankii Isxaaq ina Ibraahim. Ibraahim Isxaaq buu dhalay:
20 Isxaaqna afartan sannadood buu jiray markuu guursaday
Rebeqah ina Betuu'el kii dalkiisu ahaa Suuriya ee reer Fadan
Araam, iyadoo ahayd Laabaan kii dalkiisu Suuriya ahaa
walaashiis. 21 Isxaaqna naagtiisuu Rabbiga u baryay, maxaa
yeelay, madhalays bay ahayd, Rabbiguna waa ka aqbalay,
markaasay naagtiisii Rebeqah uuraysatay. 22 Carruurtiina
uurkeeday isku dhex riixriixeen; markaasay tidhi, Hadday
saas tahay, maxaan sidan u ahay? Kolkaasay u tagtay inay
Rabbiga wax weyddiiso. 23 Rabbiguna wuxuu ku yidhi iyada,
Laba quruumood baa maxalkaaga ku jirta, Oo laba dad oo
kala duwan ayaa uurkaaga ka soo bixi doona; Oo labada
dad midkood baa ka xoog badnaan doona dadka kale; Kan
weynuna wuxuu u adeegi doonaa kan ka yar. 24 Oo markii
wakhtigii ay umuli lahayd dhammaaday, bal eeg, waxaa
maxalkeedii ku jiray mataano. 25 Oo kii hore wuu soo baxay
isagoo cas, korkiisa oo dhammuna wuxuu u ekaa dhar dhogor
laga sameeyey, magiciisiina waxay u baxsheen Ceesaw.
26 Dabadeedna waxaa soo baxay walaalkiis, gacantiisuna
waxay ku dhegganayd cedhibta Ceesaw; magiciisiina waxaa
loo bixiyey Yacquub; Isxaaqna lixdan sannadood buu
jiray markay iyaga dhashay. 27 Wiilashiina way koreen:
oo Ceesaw wuxuu ahaa nin ugaadhsiga aad u yaqaan,
wuxuuna ahaa nin duurgal ah; Yacquubna wuxuu ahaa nin
aamusan oo teendhooyin degi jiray. 28 Isxaaqna wuu jeclaa
Ceesaw, maxaa yeelay, wuxuu cuni jiray hilibkiisii ugaadha;
Rebeqahna waxay jeclayd Yacquub. 29 Yacquub wuxuu
karsaday fuud; markaasaa waxaa duurka ka yimid Ceesaw,
wuuna daalanaa. 30 Markaasaa Ceesaw wuxuu Yacquub
ku yidhi, Waan ku baryayaaye, i sii aan cunee fuudkaas
cas, waayo, waan daalanahay. Sidaas daraaddeed magiciisii
waxaa loo bixiyey Edom. 31 Yacquubna wuxuu yidhi, Maanta
iga iibi curadnimadaada. 32 Markaasaa Ceesaw yidhi, Bal
eeg, geeri baan ku dhowahay; haddaba curadnimadu maxay
ii taraysaa? 33 Markaasaa Yacquub ku yidhi, Maanta ii
dhaaro. Kolkaasuu u dhaartay, curadnimadiisiina wuxuu
ka iibiyey Yacquub. 34 Yacquubna wuxuu Ceesaw siiyey
kibis iyo fuud digir laga sameeyey, wuuna cunay oo cabbay,
markaasuu intuu kacay, iska tegey. Sidaasuu Ceesaw u
quudhsaday curadnimadiisii.

**26** Waxaa dhulkii ka dhacday abaar, oo aan ahayn tii
hore oo waagii Ibraahim dhacday. Markaasaa Isxaaq u
kacay xagga Abimeleg oo ahaa boqorkii reer Falastiin xagga
Geraar. 2 Rabbiguna wuu u muuqday isaga, oo wuxuu ku
yidhi, Xagga Masar ha u dhaadhicin, laakiinse deg dhulka
aan kuu sheegi doono. 3 Dhulkan qariib ahaan u deg, oo
anna waan kula jiri doonaa, oo waan ku barakayn doonaa;
waayo, adiga iyo farcankaaga ayaan dalalkan oo dhan siin
doonaa, oo waxaan adkayn doonaa dhaartii aan ugu dhaartay
aabbahaa Ibraahim. 4 Farcankaagana waxaan u tarmin
doonaa sida xiddigaha samada, oo waxaan farcankaaga
siin doonaa dalalkan oo dhan, farcankaagayna quruumaha
dunida oo dhammu ku barakoobi doonaan; 5 maxaa yeelay,
Ibraahim baa addeecay codkaygii, wuxuuna dhawray wixii
la ii dhawri lahaa, iyo xukummadaydii, iyo amarradaydii,
iyo qaynuunnadaydii. 6 Isxaaqna wuxuu degganaa Geraar:
7 oo dadkii meeshaas joogay baa naagtiisii ka warsaday,
oo wuxuu yidhi, Iyadu waa walaashay: waayo, wuu ka
cabsaday inuu yidhaahdo, Waa naagtaydii, oo wuxuu isyidhi,
waaba intaasoo ay dadka meeshanu igu dilaan Rebeqah
aawadeed, maxaa yeelay, way suurad quruxsanayd. 8
Markuu halkaas wakhti dheer joogay ayaa Abimeleg oo ahaa
boqorkii reer Falastiin daaqad ka fiiriyey, oo uu arkay Isxaaq
oo naagtiisii Rebeqah la qooqaya. 9 Markaasuu Abimeleg
Isxaaq u yeedhay, oo yidhi, Hubaal iyadu waa naagtaadii.
De sidee baad ku tidhi, Waa walaashay? Isxaaqna wuxuu
ku yidhi, Maxaa yeelay, waxaan is-idhi, Waaba intaasoo
aad u dhimatid iyada aawadeed. 10 Oo Abimelegna wuxuu
ku yidhi, War waa maxay waxan aad nagu samaysay?
Mid dadka ka mid ahu dhib yaraan buu ula jiifsan lahaa
naagtaada, oo kolkaasaad eed noo soo jiidi lahayd. 11
Markaasaa Abimeleg wuxuu dadkii oo dhan ku amray, oo
yidhi, Kii ninkan ama naagtiisa taabta hubaal naftaa laga
qaadi doonaa. 12 Isxaaqna dhulkaasuu wax ku beertay,
isla sannaddiina wuxuu helay boqol laab; Rabbiguna wuu
barakeeyey isagii. 13 Ninkiina wuu weynaaday, oo hor
u maray, ilaa uu noqday nin aad u weyn, 14 wuxuuna
lahaa adhi iyo lo', iyo addoommo fara badan; markaasay
reer Falastiin ka masayreen. 15 Ceelashii addoommada
aabbihiis qodeen oo dhan waagii aabbihiis Ibraahim noolaa
ayay reer Falastiin hore u awdeen oo ciid uga buuxiyeen.
16 Abimelegna wuxuu Isxaaq ku yidhi, Naga tag; waayo,
aad baad nooga xoog badan tahay. 17 Markaasaa Isxaaq
halkaas ka tegey, oo dooxadii Geraar degay, halkaasuuna
joogay. 18 Kolkaasaa Isxaaq mar kale qoday ceelashii biyaha
oo ay qodeen waagii aabbihiis Ibraahim noolaa, waayo,
reer Falastiin baa awday markii Ibraahim dhintay ka dib,
oo wuxuu magacyadoodii u bixiyey magacyadii aabbihiis
Ibraahim u bixiyey. 19 Markaasaa addoommadii Isxaaq
dooxadii qodeen, oo waxay ka heleen ceel durdur ah. 20
Markaasaa xoolojirradii reer Geraar la dirireen xoolojirradii
Isxaaq, iyagoo leh, Biyaha annagaa leh. Ceelka magiciisiina

wuxuu u bixiyey Ceseq, maxaa yeelay, way la dirireen isagii. **21** Ceel kalena way qodeen, oo kaasna way kula dirireen, markaasuu magiciisii u bixiyey Sitnah. **22** Kolkaasuu meeshaas ka guuray, oo wuxuu qoday ceel kale; kaasna kulama ay diririn; magiciisiina wuxuu u bixiyey Rexobod, oo wuxuu yidhi, Haatan Rabbigu meel buu noo banneeyey, oo dalka waannu ku badnaynaa. **23** Markaasuu halkaas ka tegey, oo wuxuu u kacay Bi'ir Shebac. **24** Oo isla habeenkaas ayaa Rabbigu u muuqday isagii oo ku yidhi, Waxaan ahay aabbahaa Ibraahim Ilaahiisa. Ha cabsan, waayo, waan kula jiraa, oo waan ku barakayn doonaa, farcankaagana waan tarmin doonaa addoonkaygii Ibraahim aawadiis. **25** Kolkaasuu halkaas ka dhisay meel allabari, oo magaca Rabbiga ku baryootamay, halkaas buuna teendhadiisii ka dhisay, markaasaa addoommadii Isxaaq halkaas ceel ka qodeen. **26** Dabadeedna Abimeleg iyo saaxiibkiis Axusad, iyo Fiikol oo ahaa madaxda ciidankiisa ayaa Geraar ka tegey oo Isxaaq u kacay. **27** Markaasaa Isxaaq ku yidhi, Maxaad iigu timaadeen, waabad i neceb tihiine, oo aad iska kay erideene? **28** Oo waxay yidhaahdeen, Caddaan baannu u aragnay in Rabbigu kula jiro; oo waxaannu nidhi, Annaga iyo adiga dhaaru ha inoo dhexayso oo aynu axdi dhiganno, **29** inaadan wax na yeelayn, sidii annana aannan kuu taaban, oo aannan waxba kuugu samayn wanaag mooyaane, oo aannu nabad kuugu dirnay. Adigu hadda waxaad tahay kan Rabbigu barakeeyey. **30** Diyaafad buuna u sameeyey, wayna cuneen oo cabbeen. **31** Kolkaasay aroor hore kaceen, oo isu dhaardhaarteen: markaasaa Isxaaq iska diray, iyana nabad bay kaga ambabbaxeen. **32** Oo isla maalintaas ayay addoommadii Isxaaq yimaadeen, oo ay uga warrameen ceelkii ay qodeen, oo waxay ku yidhaahdeen, Biyaannu helnay. **33** Markaasuu u bixiyey Shebcaah; sidaas daraaddeed magaaladaas magaceeda waxaa ilaa maantadan la yidhaahdaa Bi'ir Shebac. **34** Ceesaw markuu afartan sannadood jiray ayuu guursaday Yuhuudiid ina Be'eerii kii reer Xeed, iyo Basmad ina Eeloon kii reer Xeed. **35** Kuwaasuna Isxaaq iyo Rebeqah ayay caloolxumo geliyeen.

**27** Markii Isxaaq gaboobay, oo ay indhihiisii u arag darnaayeen si uusan waxba arki karin, ayuu u yeedhay wiilkiisii weynaa oo Ceesaw ahaa, oo wuxuu ku yidhi, Wiilkaygiiyow. Isaguna wuxuu yidhi, Waa i kan. **2** Markaasuu yidhi, Bal i eeg, haatan waan gaboobay, garanna maayo maalinta dhimashadayda. **3** Sidaas daraaddeed waan ku baryayaaye, qaado hubkaaga, gabooyahaaga iyo qaansadaada, oo duurka u bax, oo hilib ugaadheed ii keen; **4** oo ii samee hilib macaan, oo ah kan aan jeclahay, oo ii keen, aan cunee, inay naftaydu kuu ducayso intaanan dhiman. **5** Rebeqahna way maqashay markii Isxaaq la hadlay wiilkiisii Ceesaw. Ceesawna duurkuu u kacay inuu ugaadh soo dilo oo uu keeno. **6** Markaasay Rebeqah la hadashay wiilkeedii Yacquub, oo tidhi, Waxaan maqlay aabbahaa oo la hadlaya walaalkaa Ceesaw, isagoo leh, **7** Hilib ugaadheed ii keen, oo ii samee hilib macaan, aan cunee, oo aan kuugu duceeyee Rabbiga hortiis intaanan dhimane. **8** Haddaba sidaas daraaddeed, wiilkaygiiyow, codkayga u addeec sida aan kuugu amro. **9** Bal adhiga u kac, oo iiga keen laba waxar oo wanwanaagsan, oo waxaan aabbahaa uga samayn hilib macaan, oo ah kan uu jecel yahay, **10** adna aabbahaa waad u geeyn doontaa inuu cuno, si uu kuugu duceeyo intuusan dhiman. **11** Yacquubna wuxuu hooyadiis Rebeqah ku yidhi, Walaalkay Ceesaw waa nin xaad badan, anna waxaan ahay nin xaad yar. **12** Mindhaa aabbahay waa i taaban doonaa, oo markaasaan ula ekaan doonaa khaa'in, oo habaar baan isu soo jiidi doonaa, ducose ma heli doono. **13** Oo hooyadiis baa ku tidhi, Wiilkaygiiyow, habaarkaagu aniga ha igu dhaco: codkayga uun addeec, oo orod oo ii keen iyaga. **14** Markaasuu tegey, oo soo kaxeeyey, oo u keenay hooyadiis, hooyadiisna waxay samaysay hilib macaan, oo ah sidii kii aabbihiis jeclaa. **15** Markaasaa Rebeqah waxay soo qaadday dharkii wanaagsanaa oo wiilkeedii weynaa oo ahaa Ceesaw, oo ay guriga ku haysay, oo waxay u xidhay wiilkeedii yaraa oo ahaa Yacquub; **16** markaasay waxarihii hargahoodii ku xidhay gacmihiisii iyo intii aan xaadda lahayn oo luquntiisii. **17** Markaasay hilibkii macaanaa iyo kibistii ay diyaarisay u dhiibtay wiilkeedii Yacquub. **18** Kolkaasuu aabbihiis u yimid, oo yidhi, Aabbow. Isna wuxuu yidhi, Waa i kan. Kumaad tahay, wiilkaygiiyow? **19** Yacquubna wuxuu aabbihiis ku yidhi, Waxaan ahay curadkaagii Ceesaw. Waan sameeyey sidii aad iigu amartay. Haddaba waan ku baryayaaye, kac oo fadhiiso oo cun hilibkaygan ugaadheed, si aad iigu ducayso. **20** Isxaaqna wuxuu wiilkiisii ku yidhi, Wiilkaygiiyow, sidee baad dhaqso ugu soo heshay? Isna wuxuu yidhi, Maxaa yeelay, Rabbiga ah Ilaahaaga ayaa ii keenay. **21** Isxaaqna wuxuu Yacquub ku yidhi, Soo dhowow, waan ku baryayaaye, aan ku taabtee, wiilkaygiiyow, bal inaad tahay wiilkaygii Ceesaw iyo in kale. **22** Yacquubna waa u dhowaaday aabbihiis Isxaaq; markaasuu taabtay oo yidhi, Codku waa codkii Yacquub, gacmuhuse waa gacmihii Ceesaw. **23** Mana uu garanin, maxaa yeelay, gacmihiisu xaad miidhan bay ahaayeen sidii gacmihii walaalkiis Ceesaw; sidaas daraaddeed wuu u duceeyey. **24** Kolkaasuu yidhi, War ma tahay wiilkaygii Ceesaw qudhiisii? Isna wuxuu yidhi,

Waan ahay. 25 Markaasuu ku yidhi. Bal ii soo dhowee,
aan cunee wiilkayga hilibkiisa ugaadheed, si aan kuugu
duceeyo. Kolkaasuu u soo dhoweeyey, oo isna wuu cunay:
oo wuxuu kaloo u keenay khamri, wuuna cabbay. 26
Markaasaa aabbihiis Isxaaq ku yidhi, Bal ii soo dhowow, oo i
dhunko, wiilkaygiiyow. 27 Isna wuu u soo dhowaaday, oo
wuu dhunkaday. Markaasuu ursaday dharkiisa, wuuna u
duceeyey, oo yidhi, Bal eeg, urta wiilkaygu Waa sida urta
duurka Rabbigu barakeeyey, 28 Ilaahu ha ku siiyo sayaxa
samada, Iyo barwaaqada dhulka, Iyo hadhuudh iyo khamri
badan. 29 Dadyowgu ha kuu adeegeen, Quruumuhuna ha kuu
sujuudeen. Walaalahaa sayid u noqo, Wiilasha hooyadaana
ha kuu sujuudeen. Ha inkaarnaado ku kasta oo ku inkaaraa,
Ha ducaysnaado ku kasta oo kuu duceeyaa. 30 Markii
Isxaaq dhammeeyey ducadii uu Yacquub u ducaynayay,
Yacquubna ka tegey aabbihiis, ayaa walaalkiis Ceesaw ka
yimid ugaadhsigii. 31 Oo isna hilib macaan buu sameeyey,
oo u keenay aabbihiis; oo wuxuu ku yidhi aabbihiis, Aabbow
kac, oo cun hilibkaygan ugaadheed, si aad iigu ducayso.
32 Markaasaa aabbihiis Isxaaq ku yidhi, Kumaad tahay?
Isna wuxuu yidhi, Waxaan ahay wiilkaaga ah curadkaaga
Ceesaw. 33 Markaasuu Isxaaq aad iyo aad u gariiray, oo
yidhi, De yuu ahaa haddaba kii intuu hilib ugaadheed soo
qaaday, ii keenay, oo aan kulli cunay intaadan iman ka
hor, oo aan u duceeyey? Kaasu wuu ducaysnaan doonaa.
34 Ceesawna markuu maqlay hadalkii aabbihiis ayuu ku
dhawaaqay dhawaaq aad iyo aad u weyn oo daran, oo wuxuu
aabbihiis ku yidhi, Aabbahayow, anigana ii ducee. 35 Isna
wuxuu yidhi, Walaalkaa baa khiyaano iila yimid oo ducadaadii
qaatay. 36 Oo wuxuu yidhi, Miyaanay ku habboonayn in
magiciisa loo bixiyo Yacquub? Waayo, labadan goor buu i
khiyaaneeyey. Curadnimadaydii buu qaatay; haatanna wuxuu
qaatay ducadaydii. Oo wuxuu yidhi, Miyaadan duco ii reebin?
37 Isxaaqna wuu jawaabay oo wuxuu Ceesaw ku yidhi, Bal
eeg, waxaan isaga ka dhigay sayidkaagii, walaalihiis oo
dhanna waxaan u siiyey isaga inay addoommo u noqdaan,
hadhuudh iyo khamrina waan u ballanqaaday, ee maxaan
haddaba adiga kuu sameeyaa, wiilkaygiiyow? 38 Ceesawna
wuxuu aabbihiis ku yidhi, Aabbahayow, ducadaadu ma mid
keliya baa? Ii ducee anigana sidoo kale, Aabbow. Markaasuu
Ceesaw aad u qayliyey oo ooyay. 39 Markaasaa aabbihiis
Isxaaq u jawaabay oo ku yidhi, Bal eeg, rugtaadu waxay
ahaan doontaa meel ka baxsan dhulka barwaaqadiisa Iyo
sayaxa samada sare ka yimaada. 40 Oo waxaad ku noolaan
doontaa seeftaada, walaalkaana waad u adeegi doontaa,
Oo waxaa dhici doonta markaad xukunka qabsato Inaad
harqoodkiisa surkaaga ka tuuri doonto. 41 Ceesawna wuxuu
Yacquub u nebcaaday ducadii aabbihiis ugu duceeyey
aawadeed. Ceesawna wuxuu isku yidhi, Maalmihii aabbahay
loo barooran lahaa waa dhow yihiin; dabadeedna waan
dili doonaa walaalkay Yacquub. 42 Rebeqahna waxaa
loo sheegay hadalkii wiilkeedii weynaa oo ahaa Ceesaw;
markaasay intay u cid dirtay u yeedhay wiilkeedii yaraa oo
ahaa Yacquub, oo waxay ku tidhi isagii, Bal eeg, walaalkaa
Ceesaw wuxuu isku qalbi qabowjiyaa talajirka uu ku talo jiro
inuu ku dilo. 43 Haddaba sidaas daraaddeed wiilkaygiiyow,
codkayga addeec. Kac oo u carar walaalkay Laabaan
xagga Haaraan; 44 oo dhawr maalmood isaga la joog, ilaa
walaalkaa ciilku ka ba'ayo, iyo ilaa walaalkaa cadhaduu
kuu qabo ka ba'ayso, 45 oo uu ka illoobayo wixii aad ku
samaysay: dabadeedna waan kuu soo cid diri doonaa, oo
halkaasaan kaa soo kaxayn doonaa. Maxaan labadiinnaba
isku maalin idiin waayayaa? 46 Rebeqahna waxay Isxaaq
ku tidhi, Naftaydu waa rafaadsan tahay gabdhaha reer
Xeed dartood. Haddii Yacquub naag ka guursado gabdhaha
reer Xeed oo kuwan oo kale ah, kuwaas oo ah gabdhaha
waddanka, noloshaydu maxay igu taraysaa?

28 Isxaaqna wuxuu u yeedhay Yacquub, wuuna u
duceeyey, oo wuxuu ku amray, oo ku yidhi, Waa
inaadan naag ka guursan gabdhaha reer Kancaan. 2 Kac
oo xagga Fadan Araam tag, iyo xagga gurigii Betuu'el
oo ah hooyadaa aabbeheed; oo halkaas naag ka guurso
gabdhaha Laabaan oo ah hooyadaa walaalkeed. 3 Oo
Ilaaha Qaadirka ahu ha ku barakeeyo, oo ha ku badiyo,
oo ha ku tarmiyo, inaad noqotid dad faro badan, 4 oo ha
ku siiyo barakadii Ibraahim, adiga iyo farcankaaga kula
joogaba, inaad dhaxashid dalka aad qariibka ku tahay, oo
Ilaah Ibraahim siiyey. 5 Isxaaqna Yacquub wuu diray: oo
wuxuu u kacay Fadan Araam xagga Laabaan, ina Betuu'el
kii reer Suuriya, oo ahaa Rebeqah walaalkeed tii ahayd
Yacquub iyo Ceesaw hooyadood. 6 Ceesawna wuxuu arkay
in Isxaaq u duceeyey Yacquub oo u diray Fadan Araam,
inuu halkaas naag ka guursado, iyo inuu markuu u duceeyey
amray, oo ku yidhi, Waa inaadan naag ka guursan gabdhaha
reer Kancaan; 7 iyo in Yacquub addeecay aabbihiis iyo
hooyadiis, oo uu u kacay xagga Fadan Araam. 8 Oo Ceesaw
wuxuu arkay inaanay gabdhaha reer Kancaan ka farxin
aabbihiis Isxaaq. 9 Markaasuu Ceesaw wuxuu u kacay xagga
Ismaaciil, oo wuxuu naagihii uu qabay ku daray Mahalad
gabadhii Ismaaciil ina Ibraahim, taas oo ahayd Nebayod
walaashiis, si ay naagtiisii u noqoto. 10 Yacquubna waa ka
tegey Bi'ir Shebac, oo wuxuu u kacay xagga Haaraan. 11
Oo meel buu gaadhay oo halkaasuu habeenkii oo dhan

joogay, maxaa yeelay, qorraxdu way dhacday, markaasuu
qaaday mid ka mid ah dhagxantii meeshaas, oo barkaday,
halkaasuuna jiifsaday si uu u seexdo. 12 Wuuna riyooday,
oo riyadiisii wuxuu ku arkay sallaan dhulka qotoma oo
caaraddiisiina samada gaadhay, wuxuuna arkay malaa'igihii
Ilaah oo ku koraya, kuna soo degaya. 13 Oo bal eeg,
Rabbigaa isdul taagay, oo yidhi, Waxaan ahay Rabbiga ah
Ilaaha awowgaa Ibraahim, iyo Ilaaha Isxaaq. Dhulka aad
ku jiifto, waxaan siin doonaa adiga iyo farcankaaga. 14
Farcankaaguna wuxuu noqon doonaa sida ciidda dhulka,
oo waxaad ku firdhi doontaan tan iyo galbeed, iyo bari, iyo
tan iyo woqooyi, iyo koonfur: oo adiga iyo farcankaagay
qabiilooyinka dhulka oo dhammu ku barakoobi doonaan. 15
Oo bal eeg, waan kula jiraa, meel alla meeshii aad tagtidna
waan kugu dhawri doonaa, dalkanna mar kalaan kugu
soo celin doonaa; waayo, anigu kaa tegi maayo ilaa aan
sameeyo wixii aan kugula hadlay. 16 Markaasuu Yacquub
ka toosay hurdadiisii, oo wuxuu yidhi, Hubaal Rabbigaa
halkan jooga, mana aan ogayn. 17 Wuuna cabsaday, oo
wuxuu yidhi, Meeshanu cabsi badanaa! Tanu meel kale ma
aha, gurigii Ilaah mooyaane, tanuna waa iriddii samada. 18
Yacquubna aroor horuu kacay, oo wuxuu qaaday dhagaxii
uu barkaday, oo sidii tiir buu u qotomiyey, kolkaasuu saliid
ku dul shubay. 19 Meeshaas magaceediina wuxuu u bixiyey
Beytel: laakiinse markii hore magaalada magaceedu wuxuu
ahaa Luus. 20 Yacquubna nidar buu nidray, oo wuxuu yidhi,
Haddii Ilaah ila jiro, oo uu jidkan aan socdo igu dhawro, oo
uu i siiyo wax aan cuno, iyo dhar aan xidho, 21 oo aan aniga
oo nabad qaba ku soo noqdo gurigii aabbahay, markaas
Rabbigu wuxuu ii noqon doonaa Ilaah, 22 oo dhagaxan aan
sidii tiir u qotomiyey, wuxuu noqon doonaa guriga Ilaah: oo
wax alla wixii aad i siisidna hubaal meel tobnaadka adigaan
ku siin doonaa.

**29** Yacquubna sodcaalkiisii buu iska sii watay, oo wuxuu
yimid dalkii reer bari. 2 Kolkaasuu wax fiiriyey, oo
wuxuu arkay ceel berrinka ku dhex yaal, oo waxaa joogay
saddex qaybood oo ido ah oo agtiisa jiifjiifa, maxaa yeelay,
ceelkaasay idaha ka waraabin jireen. Dhagaxa ceelka
afkiisa saarnaana aad buu u weynaa. 3 Oo halkaasaa
idaha oo dhan lagu soo ururin jiray: kolkaasay dhagaxa
ceelka afkiisa ka rogi jireen, oo idaha ka waraabin jireen,
markaasay mar labaad dhagaxa ceelka afkiisa saari jireen
oo ku celin jireen meeshiisii. 4 Markaasaa Yacquub ku
yidhi, Walaalahayow, xaggaad ka timaadeen? Iyana waxay
yidhaahdeen, Waxaannu ka nimid Haaraan. 5 Markaasuu ku
yidhi, Ma taqaaniin Laabaan oo ah ina Naaxoor? Markaasay
ku yidhaahdeen, Waannu naqaan. 6 Markaasuu ku yidhi,
Ma nabad qabaa? Iyana waxay yidhaahdeen, Haah, wuu
nabad qabaa. Waa taas gabadhiisii Raaxeel idaha soo
kaxaynaysa. 7 Oo wuxuu ku yidhi iyagii, Bal eega, weli
waa maalin weyn, mana aha goortii xoolaha la soo wada
ururin lahaa. Idaha waraabiya, oo kaxeeya oo daajiya. 8
Iyana waxay yidhaahdeen, Ma yeeli karno taas, jeeray
idoyowga oo dhammu isu yimaadaan, oo dhagaxa ceelka
afkiisa laga rogo; markaasaannu idaha waraabinaynaa.
9 Oo intuu weli la hadlayay ayaa Raaxeel keentay idihii
aabbeheed, waayo, iyadaa ilaalin jirtay. 10 Oo Yacquub
markuu arkay Raaxeel oo ahayd gabadhii abtigiis Laabaan,
iyo idihii abtigiis Laabaan, ayuu u dhowaaday, oo dhagaxii
ka rogay ceelka afkiisa, oo uu waraabiyey idihii abtigiis
Laabaan. 11 Markaasuu Yacquub Raaxeel dhunkaday,
wuuna qayliyey oo ooyay. 12 Yacquubna wuxuu Raaxeel u
sheegay inuu yahay aabbeheed xigaalkiis, oo uu yahay wiilkii
Rebeqah; kolkaasay orodday oo u sheegtay aabbeheed.
13 Oo Laabaan markuu maqlay warkii Yacquub oo ahaa
wiilkii walaashiis ayuu ku orday inuu ka hor tago, markaasuu
isku duubay, oo dhunkaday, oo uu gurigiisii keenay. Isna
wuxuu Laabaan u sheegay waxyaalahan oo dhan. 14
Laabaanna wuxuu ku yidhi isagii, Hubaal waxaad tahay
laftayda iyo jidhkayga. Wuxuuna la joogay isagii intii bil ah.
15 Markaasaa Laabaan Yacquub ku yidhi, Walaalkayga aad
tahay aawadeed ma habboon tahay inaad mushahaarola'aan
iigu shaqaysid? Bal ii sheeg, mushahaaradaadu maxay
ahaan doontaa? 16 Laabaanna wuxuu lahaa laba gabdhood:
midda weyn magaceedu wuxuu ahaa Lee'ah, tan yar
magaceeduna wuxuu ahaa Raaxeel. 17 Lee'ahna way
indha darnayd, laakiinse Raaxeel way quruxsanayd, suurad
wanaagsanna way lahayd. 18 Yacquubna wuxuu jeclaa
Raaxeel; markaasuu yidhi, Toddoba sannadood baan kuugu
shaqayn gabadhaada yar oo Raaxeel ah. 19 Laabaanna
wuxuu yidhi, Waa wanaagsan tahay inaan adiga ku siiyo intii
aan iyada nin kale siin lahaa, ee ila joog. 20 Yacquubna
toddoba sannadood buu u shaqaynayay Raaxeel aawadeed;
waxayna la ahaayeen maalmo yar, waana jacaylkii uu
iyada u qabay aawadiis. 21 Yacquubna wuxuu Laabaan ku
yidhi, Maalmahaygii way dhammaystirmeen; ee naagtayda
i sii, si aan ugu tago iyada. 22 Markaasuu Laabaan soo
ururiyey nimankii meeshaas joogay oo dhan, oo wuxuu
sameeyey diyaafad. 23 Oo waxay noqotay inuu fiidkii
kaxeeyey gabadhiisii Lee'ah, oo uu u geeyey isagii; isna
wuu u tegey iyadii. 24 Laabaanna wuxuu gabadhiisii Lee'ah
siiyey Silfah oo isaga addoon u ahayd inay iyada addoon
u noqoto. 25 Yacquubna wuxuu aroortii arkay inay tahay

Lee'ah, oo wuxuu Laabaan ku yidhi, Waa maxay waxan aad
igu samaysay? Miyaanan Raaxeel kuugu shaqaynayn? De
maxaad haddaba ii khiyaanaysay? 26 Laabaanna wuxuu
yidhi, Dhulkayaga sidaas laguma sameeyo in tan yar curadda
la dhaafiyo. 27 Bal tan toddobaadkeeda dhammee, tan
kalena waxaannu kugu siin doonnaa shuqulka aad toddoba
sannadood oo kale ii shaqayn doontid. 28 Yacquubna
sidii buu yeelay, toddobaadkeediina wuu dhammeeyey.
Markaasuu Laabaan Yacquub siiyey gabadhiisii Raaxeel
inay naag u noqoto. 29 Laabaanna wuxuu gabadhiisii
Raaxeel siiyey Bilhah oo isaga addoon u ahayd inay iyada
addoon u noqoto. 30 Oo Raaxeelna wuu u tegey, oo isna
Raaxeel aad buu uga jeclaa Lee'ah, toddoba sannadood
oo kalena wuu u shaqeeyey isaga. 31 Rabbiguna wuxuu
arkay in Lee'ah la nebcaaday, markaasuu maxalkeedii furay;
laakiinse Raaxeel waxay ahayd madhalays. 32 Lee'ahna
way uuraysatay, oo waxay dhashay wiil, magiciisiina waxay
u bixisay Ruubeen, oo waxay tidhi, Sababtu waxaa weeye
inuu Rabbigu dhibaatadayda arkay, oo haatan ninkaygu
wuu i jeclaan doonaa. 33 Oo haddana way uuraysatay mar
labaad, waxayna dhashay wiil, oo waxay tidhi, Rabbigu waa
maqlay in lay nebcaaday, oo haddaba taas aawadeed ayuu
ii siiyey wiilkanna; magiciisiina waxay u bixisay Simecoon. 34
Oo haddana mar kalay uuraysatay, oo waxay dhashay wiil,
waxayna tidhi, Haatan ninkayga ayaa ila jiri doona, maxaa
yeelay, saddex wiil baan u dhalay isaga; sidaas daraaddeed
magiciisii waxaa loo bixiyey Laawi. 35 Oo haddana way
uuraysatay, oo waxay dhashay wiil; oo waxay tidhi, Haatan
Rabbigaan ammaani, sidaas daraaddeed waxay magiciisii u
bixisay Yahuudah; wayna dhalmo daysay.

30 Raaxeelna markay aragtay inaanay Yacquub carruur
u dhalin, ayay walaasheed ka masayrtay; oo waxay
Yacquub ku tidhi, Carruur i sii, haddii kalese waan dhiman.
2 Markaasaa Yacquub aad ugu cadhooday Raaxeel; oo
wuxuu ku yidhi, Ma anigaa ku jira meeshii Ilaaha midhihii
maxalka kuu diiday? 3 Markaasay tidhi, Bal eeg addoontayda
Bilhah, u tag iyada, inay jilbahayga ku dul dhasho, oo
aan anna carruur ku helo iyada. 4 Markaasay isagii siisay
addoonteedii Bilhah inuu naag ka dhigto; Yacquubna wuu
u tegey iyadii. 5 Bilhahna way uuraysatay, oo Yacquub
wiil bay u dhashay. 6 Raaxeelna waxay tidhi, Ilaah waa
i xukumay, codkaygiina wuu maqlay, oo wiil buu i siiyey.
Sidaas daraaddeed magiciisii waxay u bixisay Daan. 7 Bilhah
oo ahayd addoontii Raaxeel mar kalay uuraysatay, oo waxay
Yacquub u dhashay wiil labaad. 8 Oo Raaxeelna waxay
tidhi, Legdan aad u weyn baan walaashay la legdamay,
waanan ka adkaaday. Magiciisiina waxay u bixisay Naftaali. 9
Lee'ahna markay aragtay inay dhalmo daysay ayay kaxaysay
addoonteedii Silfah, oo waxay siisay Yacquub inuu naag
ka dhigto. 10 Lee'ah addoonteedii Silfah ahaydna Yacquub
wiil bay u dhashay. 11 Oo Lee'ahna waxay tidhi, Ayaan
weynaa! Magiciisiina waxay u bixisay Gaad. 12 Lee'ah
addoonteedii Silfah ahaydna wiil labaad bay u dhashay
Yacquub. 13 Oo Lee'ahna waxay tidhi, Waan faraxsanahay!
waayo, naaguhu waxay iigu yeedhi doonaan tan faraxsan.
Magiciisiina waxay u bixisay Aasheer. 14 Maalmihii sarreenka
la goosanayay ayaa Ruubeen tegey berrinka oo ka dhex
helay ubax, oo wuxuu u keenay hooyadiis Lee'ah. Markaasay
Raaxeel waxay Lee'ah ku tidhi, Waan ku baryayaaye,
wax iga sii ubaxa wiilkaaga. 15 Iyana waxay ku tidhi, Ma
wax yar baa inaad ninkaygii iga qaadday? Weliba ubaxa
wiilkaygana ma iga qaadan lahayd? Raaxeelna waxay tidhi,
Haddaba wiilkaaga ubaxiisa aawadiis isagu caawa wuu
kula seexan doonaa. 16 Yacquubna fiidkii buu beertii ka
yimid, markaasay Lee'ah ka hor tagtay oo waxay tidhi, Waa
inaad ii timaadaa, waayo, hubaal waxaan kugu kiraystay
ubaxii wiilkayga. Habeenkaasna iyadii buu la seexday. 17
Ilaahna wuu maqlay Lee'ah, wayna uuraysatay, oo Yacquub
bay u dhashay wiil shanaad. 18 Lee'ahna waxay tidhi,
Ilaah waa i siiyey kiradaydii, maxaa yeelay, addoontaydii
waxaan siiyey ninkayga. Wiilkii magiciisiina waxay u bixisay
Isaakaar. 19 Lee'ahna mar kalay uuraysatay, oo waxay
Yacquub u dhashay wiil lixaad. 20 Lee'ahna waxay tidhi,
Ilaah dhiibaad wanaagsan buu igu dhiibaadiyey, haatan buu
ninkaygu ila joogi doonaa, maxaa yeelay, waxaan u dhalay
lix wiil. Wiilkii magiciisiina waxay u bixisay Sebulun. 21
Dabadeedna waxay dhashay gabadh, magaceediina waxay
u bixisay Diinah. 22 Ilaahna wuu xusuustay Raaxeel, oo
Ilaah wuu maqlay iyada, maxalkeediina wuu u furay. 23
Oo way uuraysatay, oo wiil bay dhashay; oo waxay tidhi,
Ilaah baa ceebtaydii iga qaaday. 24 Magiciisiina waxay u
bixisay Yuusuf, iyadoo leh Rabbigu wiil kale ha iigu daro.
25 Markii Raaxeel Yuusuf dhashay ka dib ayaa Yacquub
Laabaan ku yidhi, Iska kay dir, si aan u tago meeshaydii,
iyo dalkaygii. 26 I sii naagahayga iyo carruurtayda aan
daraaddood kuugu adeegay, oo aan iska tago; waayo waad
og tahay adeegiddii aan kuu adeegi jiray. 27 Laabaanna
wuxuu ku yidhi isagii, Haddaad raalli iga tahay, joog, waayo,
waxaan faal ku gartay in Rabbigu daraaddaa ii barakeeyey.
28 Oo wuxuu yidhi, Mushahaaradaada ii sheeg, oo waan ku
siin doonaa. 29 Oo isna wuxuu ku yidhi, Waad og tahay
sidii aan kuugu adeegay, iyo sidii xoolahaagii aan daaqi
jiray xaalkoodu ahaa. 30 Waayo, waxaad haysan jirtay wax

yar bay ahayd intaanan iman ka hor, waana ay korodhay
oo waxay noqotay wax faro badan; Rabbiguna wuu kugu
barakeeyey dhinacii aan u kacayba; de haddaba goormaan
reerkaygana wax u dhaqan doonaa? 31 Oo isna wuxuu
yidhi, Maxaan ku siiyaa? Yacquubna wuxuu yidhi, Waa
inaanad waxba i siin, laakiin haddaad waxan ii samaysid,
adhigaaga haddana waan daajin oo waan ilaalin doonaa. 32
Maanta adhigaaga oo dhan waan dhex mari doonaa, oo
waxaan ka sooci doonaa mid kasta oo dhibicyo iyo barbaro
leh, iyo mid kasta oo madow oo idaha ku dhex jira, iyo inta
barbaraha iyo dhibicyada leh oo riyaha ku jirta; oo waxaasu
waxay noqon doonaan mushahaaradayda. 33 Oo sidaasay
xaqnimadaydu iigu jawaabi doontaa hadda ka dib, goortaad
timaadid oo ka hadlaysid mushahaaradayda ku hor taal.
Mid kasta oo aan dhibicyo ama barbaro lahayn oo riyaha
ku jira, iyo mid kasta oo aan madoobayn oo idaha ku jira,
haddii layga helo, waxaa lagu tirin doonaa wax la soo xaday.
34 Laabaanna wuxuu yidhi, Waa hagaag, sidaad tidhi ha
noqoto. 35 Oo maalintaasuu wada soocay orgidii xariijimaha
iyo barbaraha lahayd, iyo riyihii dhibicyada iyo barbaraha
lahaa oo dhan, mid kasta oo caddaani ku jirto, iyo kuwa
madmadow oo idaha ku jira oo dhan, oo wuxuu gacanta
u geliyey wiilashiisii; 36 Oo wuxuu Yacquub ka fogaaday
intii saddex maalmood loo socdo, Yacquubna wuxuu daajin
jiray Laabaan adhigiisii intii ka hadhay. 37 Yacquubna wuxuu
qaatay dhengedo qoyan oo ah geedihii la odhan jiray libneh
iyo yicib iyo carmon, kolkaasuu diiray oo xariijimo cadcad
ku sameeyey. 38 Markaasuu dhengedihii uu diiray adhigii
hor dhigay oo ku riday dararkii berkedaha oo adhigu ka
cabbi jiray; wayna rimeen markay soo arooreen. 39 Adhigiina
dhengedihii hortooda ayuu ku rimay, wuxuuna dhalay maqal
xariijimo iyo dhibicyo iyo barbaro leh. 40 Markaasuu Yacquub
naylihii ka soocay oo wuxuu adhigii u jeediyey xagga kuwii
xariijimaha lahaa iyo intii madmadoobayd oo dhan ee adhigii
Laabaan; markaasuu gooni u soocay goosankiisii, kumana
uu darin adhigii Laabaan. 41 Markii adhiga intiisii xoogga
lahayd rintay ayaa Yacquub dhengedihii adhiga indhihiisa
hor dhigay intuu dararkii ku riday, inay dhengedihii ku dhex
rimaan; 42 laakiinse adhiga qaarkii caatada ahaa, uma
uu dhex gelin jirin; sidaas daraaddeed intii caatada ahayd
waxaa lahaa Laabaan, intii xoogga lahaydna waxaa lahaa
Yacquub. 43 Ninkiina aad buu u xoolo batay, wuxuuna lahaa
adhi badan, iyo naago addoommo ah, iyo niman addoommo
ah, iyo geel, iyo dameerro.

**31** Wuxuu maqlay hadalkii Laabaan wiilashiisii, iyagoo leh,
Yacquub baa wixii aabbeheen oo dhan wada qaatay,
oo xoolahan oo dhan wuxuu ku helay wixii aabbeheen. 2
Yacquubna wuxuu fiiriyey wejigii Laabaan, oo wuxuu arkay
inuusan sidii hore u ahayn. 3 Rabbiguna wuxuu Yacquub
ku yidhi, Ku noqo dalkii aabbahaa iyo xigaalkaaga, oo
anna waan kula jiri doonaa. 4 Yacquubna wuxuu u cid
diray oo u yeedhay Raaxeel iyo Lee'ah inay yimaadaan
berrinkii adhigiisu joogay, 5 oo wuxuu iyagii ku yidhi,
Waxaan arkay wejigii aabbihiin inuusan sidii hore ii ahayn,
laakiinse Ilaaha aabbahay baa ila jiray. 6 Idinkuna waad og
tihiin inaan aabbihiin xooggayga oo dhan ugu adeegay. 7
Laakiin aabbihiin wuu i khiyaaneeyey, oo toban goor buu
mushahaaradaydii beddelay; Ilaahse uma oggolaan inuu
wax i yeelo. 8 Hadduu yidhi, Kuwa dhibicyada lahu waxay
noqon doonaan mushahaaradaada, adhiga oo dhammu wax
dhibicyo leh bay dhaleen; hadduu yidhina, Kuwa xariijimaha
lahu waxay noqon doonaan mushahaaradaada, adhiga oo
dhammu wax xariijimo leh bay dhaleen. 9 Sidaasaa Ilaah
aabbihiin xoolihiisii uga qaaday, oo uu aniga ii siiyey. 10
Wakhtigii adhigii rimay ayaan indhahayga kor u taagay, oo
aan riyo ku arkay orgidii adhiga ku boodday inay wada
lahaayeen xariijimo, iyo dhibicyo iyo barbaro. 11 Malaa'igtii
Ilaahna waxay igu tidhi intaan riyoonayay, Yacquubow.
Oo anna waxaan idhi, Waa i kan. 12 Oo waxay tidhi,
Haatan indhahaaga kor u taag, oo arag, orgida adhiga
ku boodda oo dhammu waxay wada leeyihiin xariijimo iyo
dhibicyo iyo barbaro, maxaa yeelay, waxaan wada arkay
waxa Laabaan kugu sameeyo oo dhan. 13 Waxaan ahay
Ilaaha Beytel, meeshii aad tiirka ku subagtay, oo aad nidarka
iigu nidartay. Haddaba kac, oo dalkan ka bax, oo ku noqo
dalkii aad ku dhalatay. 14 Markaasay Raaxeel iyo Lee'ah
u jawaabeen isagii oo ku yidhaahdeen, Weli ma qayb
baa guriga aabbahayo noogu hadhay amase dhaxal? 15
Miyaannan xaggiisa ka xisaabnayn shisheeye? Waayo, wuu
na iibiyey, oo weliba lacagtayadiina wuu cunay. 16 Waayo,
kulli maalkii Ilaah ka qaaday aabbahayo waxaa leh annaga
iyo carruurtayada; haddaba yeel wixii Ilaah kugu yidhi. 17
Markaasuu Yacquub kacay, carruurtiisii iyo naagihiisiina
wuxuu fuushiiyey awrtii; 18 wuuna la tegey xoolihiisii oo
dhan, iyo alaabadii uu urursaday, kuwaas oo ahaa xoolihii
uu helay, oo uu ku ururiyey Fadan Araam, inuu tago xaggii
aabbihiis Isxaaq iyo ilaa dalkii Kancaan. 19 Laabaanna
wuxuu ku maqnaa inuu idihiisa dhogorta ka soo xiirto;
kolkaasay Raaxeel xadday sanamyadii aabbeheed lahaa. 20
Markaasaa Yacquub si qarsoon uga tegey Laabaankii reer
Suuriya oo aan ogayn, umana uu sheegin inuu cararayo.
21 Oo sidaasuu ula cararay wixii uu haystay oo dhan, oo
intuu kacay, ayuu webigii ka gudbay, oo wejigiisii ku toosiyey

buurtii Gilecaad. 22 Maalintii saddexaad baa Laabaan loo
sheegay in Yacquub cararay. 23 Markaasuu walaalihiis
kaxaystay, oo wuxuu raacdaynayay toddoba maalinsocod,
wuxuuna ku gaadhay buurtii Gilecaad. 24 Markaasaa Ilaah
riyo habeennimo ugu yimid Laabaankii reer Suuriya, oo ku
yidhi, Iska jir oo Yacquub xumaan iyo wanaag toona ha kula
hadlin. 25 Laabaanna wuu soo gaadhay Yacquub. Haddaba
Yacquub teendhadiisii wuxuu ka dhistay buurta; Laabaanna
walaalihiis buu kala dhistay buurtii Gilecaad. 26 Laabaanna
wuxuu Yacquub ku yidhi, Waa maxay waxan aad samaysay,
oo maxaad si qarsoon iiga soo tagtay anoo aan ogayn, oo
aad gabdhahayga ula soo carartay sidii iyagoo ah maxaabiis
seef lagu soo dhacay? 27 Maxaad qarsoodiga ugu soo
carartay, oo aad si qarsoon iiga soo tagtay? Oo maxaad iigu
sheegi weyday, si aan kuugu soo ambabbixiyo rayrayn iyo
gabayo iyo daf iyo kataarad? 28 Oo maxaad iigu oggolaan
weyday inaan dhunkado wiilashayda iyo gabdhahayga?
De taas nacasnimaad u yeeshay. 29 De xoog aan wax
kugu yeelo waan leeyahay, laakiinse Ilaaha aabbahaa baa
xalay ila hadlay, oo wuxuu igu yidhi, Iska jir oo Yacquub
ha kula hadlin xumaan iyo wanaag toona. 30 Oo haatan
waad tagtay, maxaa yeelay, aad baad ugu hilowday gurigii
aabbahaa, laakiinse maxaad ilaahyadayda iiga soo xadday?
31 Yacquubna waa u jawaabay oo wuxuu Laabaan ku yidhi,
Maxaa yeelay, waan cabsaday; waayo, waxaan is-idhi, Wuu
kaa xoogi doonaa gabdhihiisa. 32 Qofkii aad ilaahyadaadii
ka hesho waa inuusan noolaan. Walaalahayo hortooda ku
fiiri wixii aan kaa haysto, oo iska qaado. Waayo, Yacquub
ma uu ogayn inay Raaxeel soo xadday. 33 Laabaanna
wuxuu galay teendhadii Yacquub, iyo teendhadii Lee'ah,
iyo teendhadii labada addoommood, laakiinse ma uu helin.
Oo intuu ka baxay teendhadii Lee'ah ayuu galay teendhadii
Raaxeel. 34 Raaxeelna way qaadday sanamyadii, oo waxay
gelisay heeryadii awrta, wayna ku fadhiisatay. Laabaanna
wuu ka wada baadhay teendhadii oo dhan, mana uu helin.
35 Oo waxay aabbeheed ku tidhi, Sayidkaygiiyow, ha u
cadhoon inaanan istaagi karin, waayo, caadadii dumarku heli
jiray baan qabaa. Isna wuu baadhay, laakiinse sanamyadii
ma uu helin. 36 Yacquubna wuu cadhooday, oo Laabaan
wuu la murmay; Yacquubna wuu u jawaabay oo wuxuu
Laabaan ku yidhi, Waa maxay xadgudubkaygu? Waa maxay
dembigayga aad aawadiis aad iigu soo raacdaysatay? 37
Waxaad baadhay alaabtayda oo dhan, ee maxaad ka heshay
oo ah alaabtii gurigaaga? Halkan soo hor dhig walaalahayga
iyo walaalahaaga, inay labadeenna inoo kala gar naqaan.
38 Labaatan sannadood baan kula joogay; laxahaaga iyo
riyahaaguna dhicis ma dhalin, wananka idahaagiina ma aan
cunin. 39 Kuwii dugaagu ka cunayna kuuma aan keenin;
laakiinse anaa kuu magdhabay, anaad i weyddiisan jirtay,
ha ahaadeen wixii maalin lagaa xado ama wixii habeen
lagaa xado ee. 40 Maalintii kulayl baa i dili jiray, habeenkiina
dhaxan; hurdadiina waa iga tagtay. Oo sidaasaan ahaan
jiray. 41 Labaatan sannadood baan gurigaaga joogay; afar
iyo toban sannadood waxaan kuugu shaqeeyey labadaada
gabdhood aawadood, lix sannadoodna adhigaaga aawadiis.
Mushahaaradaydiina waxaad beddeshay toban goor. 42
Ilaaha aabbahay, oo ah Ilaaha Ibraahim, iyo kan Isxaaq ka
cabsado, haddii uusan ila jirin, hubaal haatan waxaad i diri
lahayd anoo faro madhan. Ilaah wuxuu arkay dhibaatadaydii
iyo hawshii gacmahayga, kolkaasuu xalay ku canaantay. 43
Laabaanna wuu u jawaabay oo wuxuu Yacquub ku yidhi,
Gabdhuhu waa gabdhahayga, carruurtuna waa carruurtayda,
adhiguna waa adhigayga, oo waxa aad aragto oo dhammuna
waa waxayga, haddaba maxaan maanta ku samayn karaa
gabdhahaygan, ama carruurtooda ay dhaleen? 44 Haddaba
kaalay, aan aniga iyo adigu axdi dhigannee, hana noqdo
markhaati ina dhex yaal aniga iyo adiga. 45 Markaasaa
Yacquub dhagax soo qaaday, oo sidii tiir u qotomiyey. 46
Yacquubna wuxuu walaalihiis ku yidhi, Dhagaxyo soo ururiya;
kolkaasay dhagaxyo soo gureen, oo meel taalleeyeen;
kolkaasay taallada agteedii wax ku cuneen. 47 Laabaanna
wuxuu meeshaas u bixiyey Yegar Sahaduta; Yacquubse
wuxuu u bixiyey Galceed. 48 Laabaanna wuxuu yidhi,
Maanta taalladanu waa markhaati ina dhex yaal aniga iyo
adiga. Sidaas daraaddeed waxaa magaceedii loo bixiyey
Galceed, iyo Misfaah, 49 waayo, wuxuu yidhi, Rabbigu
ha dhawro aniga iyo adiga dhexdeenna markaynu kala
maqan nahay. 50 Haddaad gabdhahayga dhibtid, ama
aad naago kale gabdhahayga la guursatid, ninna inalama
joogo, balse ogow, Ilaah baa markhaati dhexdeenna ka ah
aniga iyo adiga. 51 Laabaanna wuxuu Yacquub ku yidhi,
Bal eeg taalladan, oo bal fiiri tiirka aan ina dhex dhigay
aniga iyo adiga. 52 Taalladanu markaati ha ka noqoto,
tiirkuna markhaati ha ka noqdo, inaanan taalladan kuugu
soo dhaafayn inaan wax ku yeelo, adna aadan taalladan iyo
tiirkan iigu soo dhaafayn inaad wax i yeeshid. 53 Kan ah
Ilaaha Ibraahim, iyo Ilaaha Naaxoor, iyo Ilaaha aabbahood,
ha ina kala xukumo innaga. Yacquubna wuxuu ku dhaartay
Kan aabbihiis Isxaaq ka cabsado. 54 Yacquubna allabari
buu buurtii ku bixiyey, walaalihiisna wuxuu ugu yeedhay
inay wax cunaan; cuntadiina way cuneen, habeenkii oo
dhanna buurtay joogeen. 55 Laabaanna aroor hore ayuu
kacay, wiilashiisii iyo gabdhihiisiina wuu dhunkaday, wuuna

u duceeyey; markaasuu Laabaan tegey, oo ku noqday meeshiisii.

**32** Yacquubna jidkiisii buu iska qaaday, malaa'igihii Ilaah baana ka hor yimid. 2 Yacquubna markuu iyagii arkay wuxuu yidhi, Kanu waa ciidankii Ilaah. Meeshaas magaceediina wuxuu u bixiyey Maxanayim. 3 Yacquubna wuxuu iska hor mariyey kuwo farriin wada oo wuxuu u diray walaalkiis Ceesaw oo degganaa dalkii Seciir oo ahaa duurkii Edom. 4 Wuuna amray, oo wuxuu iyagii ku yidhi, Waxaad ku tidhaahdaan sayidkayga Ceesaw, Addoonkaagii Yacquub wuxuu yidhi, Waxaan qariib ahaan ula degay Laabaan, oo ilaa haatanna waan la joogay, 5 oo waxaan haystaa dibiyo, iyo dameerro, iyo adhi, iyo niman addoommo ah iyo naago addoommo ah; oo waxaan kuugu soo cid diray inaan kuu sheego, sayidkaygiiyow, inaad raalli iga noqotid. 6 Kuwii farriinta wadayna Yacquub bay ku soo noqdeen, oo waxay ku yidhaahdeen, Waannu gaadhnay walaalkaa Ceesaw, oo weliba wuu soo socdaa inuu kaa hor yimaado isagoo wata afar boqol oo nin. 7 Markaasaa Yacquub aad u cabsaday, cidhiidhi buuna galay; kolkaasuu kala qaybiyey dadkii la jiray, iyo adhigii, iyo lo'dii, iyo geelii, oo wuxuu ka dhigay laba kooxood, 8 oo wuxuu isyidhi, Ceesaw hadduu koox u yimaado oo uu laayo, dabadeed kooxda hadha ayaa baxsan doonta. 9 Yacquubna wuxuu yidhi, Awowgay Ibraahim Ilaahiisiiyow, Aabbahay Isxaaq Ilaahiisiiyow, Ku noqo dalkaagii, iyo xigaalkaagii, oo anna wanaag baan kuu samayn doonaa, Rabbigii igu yidhiyow: 10 Ma aan istaahilo waxa ugu wada yar ee ka mid ah naxariistaada iyo daacadnimadaada ee aad addoonkaaga tustay, waayo, ushaydaan kaga soo gudbay webigan Urdun, haatanna waxaan noqday laba kooxood. 11 Waan ku baryayaaye, Iga samatabbixi gacanta walaalkay ee ah gacanta Ceesaw; waayo, isagaan ka baqayaa waaba intaasoo uu yimaadaa oo dilaa aniga iyo hooyooyinka iyo carruurta la socotaba. 12 Waxaad igu tidhi, Hubaal wanaag baan kuu samayn doonaa, farcankaagana waxaan ka dhigi doonaa sida cammuudda badda, taas oo aan la tirin karin farabadnaan aawadeed. 13 Habeenkaasna halkaas buu ku baryay, oo walaalkiis Ceesaw ayuu hadiyad uga qaaday wixii uu lahaa, 14 taas oo ah laba tiro oo riyo ah, iyo labaatan orgi, iyo laba tiro oo sabeeno ah iyo labaatan wan, 15 iyo soddon halaad oo irmaan iyo nirgahoodii, iyo afartan sac iyo toban dibi, iyo labaatan dameerood iyo toban qayl. 16 Markaasuu xoolihii u dhiibay gacantii addoommadiisa, iyadoo goosan waluba goonidiisa yahay; oo wuxuu addoommadiisii ku yidhi, Iga sii hor gudba, xoolahana goosan waluba goosanka kale cabbaar ha ka dambeeyo. 17 Oo kii ugu horreeyey ayuu amray oo wuxuu ku yidhi, Markii walaalkay Ceesaw kaa hor yimaado, oo ku weyddiiyo, isagoo ku leh, Yaa ku leh? Oo xaggee baad ku socotaa? Kuwan kaa horreeyana yaa leh? 18 waxaad ku tidhaahdaa, Waxaa leh addoonkaagii Yacquub; oo waa hadiyad loo soo diray sayidkayga Ceesaw; oo isagiina wuu naga dambeeyaa. 19 Sidaasuu ku amray kii labaad, iyo kii saddexaad, iyo kuwii goosannada daba socday oo dhan, oo wuxuu ku yidhi, Sidaas waa inaad ula hadashaan Ceesaw markaad aragtaan; 20 oo waxaad ku tidhaahdaan, Weliba addoonkaagii Yacquub waa naga dambeeyaa. Oo wuxuu yidhi, Hadiyadda iga horraysa ayaan ku cadho tirayaa isaga, dabadeedna wejigiisaan arki doonaa; oo mindhaa wuu i aqbali doonaa. 21 Sidaas daraaddeed hadiyaddii waa ka sii hor gudubtay, isna habeenkaas geeddigii buu ku dhex baryay. 22 Kolkaasuu kacay habeenkaas, oo wuxuu kaxaystay labadiisii naagood, iyo labadiisii addoommood, iyo koob iyo tobankiisi carruurta ahayd, oo wuxuu ka gudbiyey tog Yabboq marinkiisii. 23 Wuuna kaxeeyey iyagii oo wuxuu u diray durdurka shishadiisa, wixii uu haystayna wuu gudbiyey. 24 Markaasuu Yacquub keligiis hadhay, nin baana la legdamayay isaga ilaa markii waagu beryayay. 25 Oo markuu arkay inuusan ka adkaanayn ayuu taabtay godkii bowdadiisa, bowdadii Yacquubna way murkacatay, intuu la legdamayay isagii. 26 Markaasuu yidhi, I sii daa, maxaa yeelay, waagii waa beryayaa. Isna wuxuu yidhi, Ku sii dayn maayo inaad i barakaysid mooyaane. 27 Mar kaasuu ku yidhi isagii, Magacaa? Isna wuxuu yidhi, Yacquub. 28 Markaasuu ku yidhi, Magacaaga hadda ka dib lama odhan doono Yacquub, waase Israa'iil; waayo, Ilaah iyo dadba waad la dagaallantay, waanad ka adkaatay. 29 Yacquubna wuu weyddiiyey, oo wuxuu ku yidhi, Waan ku baryayaaye, ii sheeg magacaaga. Oo wuxuu yidhi, Bal maxaad u haybsanaysaa magacayga? Halkaasuuna ku barakeeyey. 30 Yacquubna meeshaas magaceedii wuxuu u bixiyey Fenii'eel; waayo, wuxuu yidhi, Ilaah fool ka fool baan u arkay, naftayduna way nabad gashay. 31 Qorraxdiina waxay soo baxday markuu Fenuu'eel dhaaftay, isna bowdadiisii buu ka dhutinayay. 32 Sidaas daraaddeed ilaa maantadan reer binu Israa'iil ma cunaan seedda misigta oo ku dul taal godka bowdada; maxaa yeelay, wuxuu taabtay godkii bowdadii Yacquub xagga seedda misigta.

**33** Markaasaa Yacquub indhihiisii kor u taagay oo wax fiiriyey, wuxuuna arkay Ceesaw oo soo socda, oo afar boqol oo nin wata. Kolkaasuu carruurtii u qaybiyey Lee'ah, iyo Raaxeel, iyo labadii addoon. 2 Markaasuu addoommihii iyo carruurtoodii ugu hor mariyey, Lee'ah iyo

carruurteediina wuu ku xigsiiyey, Raaxeel iyo Yuusufna
wuu ugu dambaysiiyey. 3 Isna markaasuu ka hor gudbay,
toddoba goor buuna sujuuday, intuusan walaalkiis u soo
dhowaan. 4 Ceesawna wuu ku soo orday inuu ka hor tago
isaga, wuuna isku duubay, oo qoortiisuu dhab yidhi, wuuna
dhunkaday, wayna ooyeen. 5 Markaasuu Ceesaw indhihiisii
kor u taagay, oo wuxuu arkay dumarkii iyo carruurtii; oo
wuxuu ku yidhi, Waa ayo kuwan kula socdaa? Isna wuxuu
yidhi, Waa carruurtii Ilaah intuu ii roonaaday i siiyey anoo ah
addoonkaaga. 6 Dabadeedna addoommihii iyo carruurtoodii
ayaa u soo dhowaaday, wayna wada sujuudeen. 7 Lee'ah
iyo carruurteediina way u soo dhowaadeen, wayna wada
sujuudeen; dabadeedna waxaa u soo dhowaaday Yuusuf iyo
Raaxeel, wayna sujuudeen. 8 Markaasuu yidhi, Maxaad
ula jeeddaa kooxahan iga hor yimid oo dhan? Isna wuxuu
yidhi, Inaad raalli iga noqotid, sayidkaygiiyow. 9 Ceesawna
wuxuu yidhi, Walaalkayow, wax igu filan baan haystaa; ee
iska hayso waxaaga. 10 Yacquubna wuxuu yidhi, Maya,
waan ku baryayaaye, haddii aad haatan raalli iga tahay, de
hadiyaddayda gacantayda ka guddoon; waayo, wejigaaga
waxaan u arkay sidii wejigii Ilaah loo arko, oo adna waad igu
faraxday. 11 Waan ku baryayaaye, guddoon hadiyaddayda
laguu keenay; maxaa yeelay, Ilaah baa ii roonaaday, oo
haddana wax igu filan baan haystaa. Aad buuna u baryay,
kolkaasuu guddoomay. 12 Oo wuxuu yidhi, Sodcaalkeenna
aan iska sii soconno, oo ina keena, oo anna waan kaa hor
marayaa. 13 Markaasuu ku yidhi isagii, Sayidkaygiiyow, waad
og tahay in carruurtu ay tabar daranyihiin, adhiga iyo lo'dana
waa la nuugaa; oo haddii maalin keliya aad loo sii kaxeeyo,
de adhigu waa wada dhimanayaa. 14 Sayidkaygiiyow, waan
ku baryayaaye, iga hor mar anigoo addoonkaaga ah, oo
anna aayar baan soo kaxayn, anoo fiirinaya tallaabada
xoolaha i hor jooga, iyo tallaabada carruurta, ilaa aan Seciir
kuugu imaado, sayidkaygiiyow. 15 Markaasaa Ceesaw ku
yidhi, Haddaba aan dadka ila jira qaar kaaga tago. Isna
wuxuu yidhi, Maxaa looga baahan yahay? Raalli iga ahow,
sayidkaygiiyow. 16 Oo maalintaasaa Ceesaw ku noqday
jidkiisii ilaa Seciir. 17 Yacquubna wuxuu u sodcaalay Sukod,
wuxuuna ka dhistay guri, xoolihiisiina wuxuu u sameeyey
xerooyin; sidaas daraaddeed meeshaas magaceeda waxaa
la yidhaahdaa Sukod. 18 Yacquubna nabad buu ku yimid
magaaladii Shekem, oo ku taal dalka Kancaan, markuu ka
yimid Fadan Araam; oo wuxuu degay magaalada horteeda.
19 Jagadii uu teendhadiisii ka dhistayna wuxuu ka iibsaday
reer Xamoor oo ahaa Shekem aabbihiis, oo wuxuu siistay
boqol xabbadood oo lacag ah. 20 Halkaasna wuxuu ka
taagay meel allabari, wuxuuna u bixiyey El-elohe-Israa'iil.

**34** Oo Diinah oo ahayd gabadhii Lee'ah ay Yacquub
u dhashay ayaa dibadda u baxday inay soo aragto
gabdhihii dalka. 2 Markaasuu Shekem ina Xamoor kii reer
Xiwi oo ahaa amiirkii dalka arkay iyadii, oo uu kaxaystay
oo la jiifsaday, wuuna ceebeeyey iyadii. 3 Naftiisiina way
raacday gabadhii Yacquub oo Diinah ahayd, wuuna jeclaaday
gabadhii, si raxmad lehna wuu ula hadlay gabadhii. 4
Markaasuu Shekem la hadlay aabbihiis Xamoor, oo yidhi,
Gabadhan ii doon aan guursadee. 5 Haddaba Yacquub
waa maqlay in Shekem gabadhiisii Diinah nijaaseeyey;
wiilashiisiina duurka ayay xoolihiisa la joogeen; Yacquubna
wuu iska aamusay ilaa ay yimaadeen. 6 Markaasaa Xamoor
oo Shekem aabbihiis ahaa Yacquub ugu tegey inuu la
hadlo isaga. 7 Oo wiilashii Yacquub ayaa duurka ka yimid
markay taas maqleen; nimankiina way caloolxumaayeen,
aad bayna u cadhaysnaayeen, maxaa yeelay, nacasnimo
buu ku sameeyey reer binu Israa'iil markuu la jiifsaday
gabadhii Yacquub, taas oo aanay jid ahayn in la sameeyo. 8
Xamoorna wuu la hadlay iyagii, oo wuxuu ku yidhi, Wiilkaygii
Shekem naftiisii aad bay u doonaysaa gabadhaada; haddaba
waan ku baryayaaye, iyada sii ha guursadee. 9 Oo aan
iska guursanno, gabdhihiinna na siiya annaga, idinkuna
gabdhahayaga guursada. 10 Oo waad nala degganaan
doontaan; dalkuna hortiinnuu oolli doonaa; degganaada
oo ku baayacmushtara dhexdiisa, oo xoolo ku yeesha. 11
Shekemna wuxuu aabbeheed iyo walaalaheed ku yidhi,
Raalli iga ahaada, oo anna wixii aad i weyddiisataan waan
idin siin. 12 In alla intii aad meher iyo yarad doonaysaan i
weyddiista, oo anna waan idin siin intii aad igu tidhaahdaan,
laakiinse gabadha i siiya aan guursadee. 13 Wiilashii
Yacquubna khiyaanay ugu jawaabeen Shekem iyo aabbihiis
Xamoor, wayna la hadleen, maxaa yeelay, walaashood
Diinah ayuu nijaaseeyey, 14 oo waxay ku yidhaahdeen,
Ma yeeli karno inaan walaashayo siinno nin buuryoqab ah;
waayo, taasu ceeb bay nagu ahaan lahayd. 15 Si uun baannu
idinku yeeli karnaa; taasuna waa haddii aad intiinna ragga
ah oo dhan iswada guddaan, oo aad noqotaan sidayada oo
kale; 16 markaasaannu gabdhahayaga idin siin doonnaa,
oo annaguna waxaan guursan doonnaa gabdhihiinna, oo
waannu idinla degganaan doonnaa, oo waxaynu noqon
doonnaa isku dad. 17 Laakiinse haddaydnan na maqlin,
inaad isguddaan, de markaas gabadhayada waannu wadan,
oo waannu tegi. 18 Hadalkoodiina waa ka farxiyey Xamoor,
iyo wiilkiisii Shekem. 19 Ninkii dhallinyarada ahaana dib
uma uu dhigin inuu taas yeelo, maxaa yeelay, aad buu
ugu faraxsanaa Yacquub gabadhiisii, Isna wuu ka wada
maamuus badnaa intii guriga aabbihiis joogtay oo dhan.

20 Markaasay Xamoor iyo wiilkiisii Shekem magaaladoodii
iriddeeda yimaadeen, oo ay raggii magaaladooda la hadleen,
oo waxay ku yidhaahdeen, 21 Nimankanu waa inala
nabad, sidaas daraaddeed dhulka ha degeen, oo ha ka
baayacmushtareen dhexdiisa, maxaa yeelay, bal eega,
dhulku waa weyn yahay oo waa ku wada filan yahay. Aynu
gabdhahooda guursanno, oo innana aan gabdhaheenna
siinno iyaga. 22 Nimanku si uun bay inagu yeelayaan inay
inala degganaadaan si aynu isku dad u noqonno, taasuna
waa haddii inteenna lab oo dhan loo gudo sida ay iyagu
u gudan yihiin. 23 Oo miyaan lo'dooda iyo alaabadooda
iyo xayawaankooda oo dhammu noqon doonin kuweenna?
Bal aynu yeelno uun, oo iyaguna way inala degganaan
doonaan. 24 Markaasaa in alla intii ka baxday magaaladiisa
iriddeeda waxay maqleen Xamoor iyo wiilkiisii Shekem;
markaasaa la wada guday intii labka ahayd oo magaaladiisa
ka baxday oo dhan. 25 Oo maalintii saddexaad, markay
dhaawaca wada ahaayeen, waxay noqotay in laba ka mid
ahaa wiilashii Yacquub oo ahaa Simecoon iyo Laawi, Diinah
walaalaheed, uu midkood kastaa seeftiisii qaatay, oo waxay
yimaadeen magaaladii, iyagoo aan la ogayn, waxayna wada
laayeen intii labka ahayd oo dhan. 26 Xamoor iyo wiilkiisii
Shekemna waxay ku dileen seef afkeed, Diinahna way kala
baxeen gurigii Shekem, wayna iska tageen. 27 Wiilashii
Yacquubna waxay yimaadeen raqdii kuwii la laayay, oo
magaaladiina way dhaceen, maxaa yeelay, walaashood
bay ka nijaaseeyeen. 28 Waxayna la tageen adhigoodii iyo
lo'doodii iyo dameerradoodii, iyo wax alla wixii magaalada u
yiil, iyo wax alla wixii duurka u joogay, 29 iyo maalkoodii
oo dhan, iyo dhallaankoodii oo dhan, iyo naagahoodiiba,
way qabsadeen oo way dhaceen, xataa wixii guryaha yiil oo
dhan. 30 Yacquubna wuxuu Simecoon iyo Laawi ku yidhi,
Dhib baad igu riddeen, maxaa yeelay, waxaad i nacsiiseen
dadka dhulka deggan, oo ah reer Kancaan, iyo reer Feris.
Haddaba anigoo dadkaygu yar yahay, ayay isu kay wada
urursan doonaan oo ay i dili doonaan; markaasna aniga iyo
reerkaygaba waa la baabbi'in doonaa. 31 Oo iyana waxay
ku yidhaahdeen, De miyey ku habboonayd inuu walaashayo
sidii dhillo ula macaamiloodo?

35 Oo Ilaah wuxuu Yacquub ku yidhi, Kac oo xagga Beytel
tag, oo halkaas deg; oo meel allabari halkaas uga
samee Ilaahii kuu muuqday markii aad walaalkaa Ceesaw ka
cararaysay. 2 Markaasaa Yacquub ku yidhi dadkii gurigiisa
iyo intii isaga la jirtay oo dhan, Iska fogeeya ilaahyada
qalaad oo idinku dhex jira, oo isdaahirsha, oo dharkiinnana
beddesha, 3 oo ina kiciya, aynu Beytel tagnee, oo anna
halkaas meel allabari baan uga samayn doonaa Ilaahii
ii jawaabay maalintii aan dhibtoonayay oo ila jiray jidkii
aan maray. 4 Markaasay Yacquub wada siiyeen ilaahyadii
qalaad oo gacantooda ku jiray, iyo hilqadihii dhegahooda
ku jiray, Yacquubna wuxuu ku qariyey geed Shekem ku
ag yiil hoostiisa. 5 Wayna sodcaaleen, magaalooyinkii ku
wareegsanaa oo dhanna cabsi weyn baa ku dhacday, mana
ay ka daba tegin reer Yacquub. 6 Yacquubna wuxuu yimid
Luus oo ku taal dalka Kancaan (taasuna waa Beytel), isagii
iyo dadkii la jiray oo dhanba. 7 Markaasuu halkaas ka
dhisay meel allabari, wuxuuna meeshii u bixiyey Elbeytel,
maxaa yeelay, Ilaah baa halkaas ugu muuqday isaga,
markuu ka cararay walaalkiis. 8 Markaasaa Debooraah
oo Rebeqah midiidinteedii ahayd dhimatay, waxaana lagu
aasay Beytel geedka hoostiisa; meeshaas magaceediina
waxaa loo bixiyey Alloon Bakuud. 9 Markaasaa Ilaah mar
kale Yacquub u muuqday, markii uu ka yimid Fadan Araam,
wuuna barakeeyey. 10 Oo waxaa Ilaah ku yidhi, Magacaagu
waa Yacquub. Hadda ka dib magacaaga lama odhan
doono Yacquub, laakiinse magacaagu wuxuu ahaan doonaa
Israa'iil. Magiciisiina wuxuu u bixiyey Israa'iil. 11 Markaasaa
Ilaah ku yidhi isaga, Waxaan ahay Ilaaha Qaadirka ah.
Wax badan dhal oo taran; quruun iyo quruumo badan
ayaa kaa iman doona, waxaa kaa soo bixi doona boqorro;
12 oo dhulkii aan siiyey Ibraahim iyo Isxaaq, adigaan ku
siin doonaa, adiga dabadaana farcankaagaan siin doonaa
dhulka. 13 Ilaahna kor buu uga tegey isagii iyo meeshii
uu kula hadlayba. 14 Yacquubna meeshii uu kula hadlay
isaga wuxuu ka taagay tiir, kaas oo ahaa tiir dhagax ah;
wuxuuna ku dul shubay qurbaan cabniin ah, saliidna wuu
ku dul shubay. 15 Yacquubna meeshii Ilaah kula hadlay
isaga magaceedii wuxuu u bixiyey Beytel. 16 Wayna ka
sodcaaleen Beytel; oo intaanay Efrad weli soo gaadhin ayaa
Raaxeel foolatay, fooshiina way ku rafaadday. 17 Oo markay
fooshii ku rafaadaysay umulisadii baa ku tidhi, Ha cabsan;
waayo, haatan waxaad dhalaysaa wiil kale. 18 Oo waxay
noqotay in, markii ay naftu ka sii baxaysay, ay magiciisii u
bixisay Benooni, waayo, way dhimatay, laakiinse aabbihiis
wuxuu u bixiyey Benyaamiin. 19 Raaxeelna way dhimatay,
waxaana lagu aasay jidka loo maro Efrad, taasuna waa
Beytlaxam. 20 Yacquubna tiir buu ka taagay qabrigeedii;
waana isla tiirka ka taagan qabrigii Raaxeel ilaa maanta.
21 Israa'iilna waa sodcaalay, oo wuxuu teendhadiisii ka
dhistay munaaraddii Ceeder shishadeeda. 22 Oo waxay
noqotay, intuu Israa'iil dhulkaas degganaa, in Ruubeen u
tegey oo la jiifsaday addoontii aabbihiis oo Bilhah ahayd;
Israa'iilna taas wuu maqlay. Wiilashii Yacquubna laba iyo

toban bay ahayeen. 23 Wiilashii Lee'ah waxay ahaayeen
Ruubeen oo ahaa curadkii Yacquub, iyo Simecoon, iyo
Laawi, iyo Yahuudah, iyo Isaakaar, iyo Sebulun. 24 Wiilashii
Raaxeelna waxay ahaayeen Yuusuf iyo Benyaamiin. 25
Addoontii Raaxeel oo Bilhah ahayd wiilasheediina waxay
ahaayeen Daan iyo Naftaali. 26 Addoontii Lee'ah oo Silfah
ahayd wiilasheediina waxay ahaayeen Gaad iyo Aasheer.
Kuwanu waa wiilashii Yacquub oo isaga ugu dhashay Fadan
Araam. 27 Markaasaa Yacquub aabbihiis Isxaaq ugu yimid
Mamre, iyo xagga Qiryad Arbac, taasuna waa Xebroon,
oo ahayd meeshii Ibraahim iyo Isxaaq qariib ahaanta u
degganaan jireen. 28 Isxaaq cimrigiisuna wuxuu ahaa boqol
iyo siddeetan sannadood. 29 Isxaaqna wuu naf baxay, wuuna
dhintay, oo wuxuu ku darmaday dadkiisii, isagoo duq ah
oo cimri weyn; markaasay wiilashiisii Ceesaw iyo Yacquub
isagii aaseen.

**36** Haddaba kuwanuna waa farcankii Ceesaw, isna waa
Edom. 2 Ceesaw wuxuu gabdhihii reer Kancaan
ka guursaday Caadah ina Eeloon kii reer Xeed, iyo
Aaholiibaamah ina Canah, oo ahayd ina Sibecoon kii reer
Xiwi, 3 iyo Basmad oo ahayd ina Ismaaciil, oo la dhalatay
Nebayod. 4 Caadahna waxay Ceesaw u dhashay Elifas,
Basmadna waxay u dhashay Recuu'eel; 5 Aaholiibaamahna
waxay u dhashay Yecuush, iyo Yaclaam, iyo Qorax; kuwanu
waa wiilashii Ceesaw, oo isaga ugu dhashay dalkii Kancaan.
6 Markaasaa Ceesaw kaxaystay naagihiisii, iyo wiilashiisii
iyo gabdhihiisii, iyo dadkii gurigiisa oo dhan, iyo lo'diisii,
iyo xayawaankiisii oo dhan, iyo wixii uu lahaa oo dhan oo
uu ku urursaday dalkii Kancaan; markaasuu tegey dal ka
fog walaalkiis Yacquub. 7 Waayo, xoolahoodu aad bay u
badnaayeen oo ma ay wada degi karin; dhulkii ay degganaan
jireenna ma uu wada qaadi karin lo'dooda aawadeed. 8
Ceesawna wuxuu degay Buur Seciir; Ceesaw waa Edom.
9 Kuwanuna waa farcankii Ceesaw oo ahaa reer Edom
aabbahood oo degganaan jiray Buur Seciir. 10 Kuwanu
waa wiilashii Ceesaw magacyadoodii, Elifas oo ahaa wiilkii
Caadah oo naagtii Ceesaw ahayd, iyo Recuu'eel oo ahaa
wiilkii Basmad oo naagtii Ceesaw ahayd. 11 Wiilashii Elifasna
waxay ahaayeen Teemaan, Oomaar, Sefoo, iyo Gactaam
iyo Qenas. 12 Timnac waxay ahayd addoontii uu Elifas
ina Ceesaw qabay, oo waxay Elifas u dhashay Camaaleq;
kuwanu waa wiilashii naagtii Ceesaw oo Caadah ahayd. 13
Kuwanuna waa wiilashii Recuu'eel: Nahad, iyo Serax, iyo
Shammah, iyo Misaah; kuwanuna waxay ahaayeen wiilashii
naagtii Ceesaw oo Basmad ahayd. 14 Kuwanuna waxay
ahaayeen wiilashii naagtii Ceesaw oo ahayd Aaholiibaamah,
gabadhii Canah oo ahayd ina Sibecoon; oo iyana waxay
Ceesaw u dhashay Yacuush, iyo Yaclaam, iyo Qorax. 15
Kuwanu waxa weeye ugaasyadii wiilashii Ceesaw. Waa
wiilashii Elifas kii ahaa curadkii Ceesaw kuwaas oo ah
ugaas Teemaan, iyo ugaas Oomaar, iyo ugaas Sefoo, iyo
ugaas Qenas, 16 ugaas Qorax, iyo ugaas Gactaam, iyo
ugaas Camaaleq. Kuwanu waa ugaasyadii Elifas dhalay
oo dalkii Edom joogay; kuwanu waa wiilashii Caadah. 17
Kuwanuna waa wiilashii Recuu'eel oo ahaa ina Ceesaw:
ugaas Nahad, iyo ugaas Serax, iyo ugaas Shammah, iyo
ugaas Misaah. Kuwanuna waa ugaasyadii uu Recuu'eel
dhalay oo dalkii Edom joogay; kuwanu waa wiilashii naagtii
Ceesaw oo Basmad ahayd. 18 Kuwanuna waa wiilashii
naagtii Ceesaw oo Aaholiibaamah ahayd: ugaas Yecuush, iyo
ugaas Yaclaam, iyo ugaas Qorax. Kuwanuna waa ugaasyadii
ay dhashay naagtii Ceesaw oo ahayd Aaholiibaamah,
gabadhii Canah. 19 Kuwanu waa wiilashii Ceesaw oo ahaa
Edom, oo kuwanu waa ugaasyadoodii. 20 Kuwanuna waa
wiilashii Seciir, kii reer Xor, oo ahaa kuwii dhulka degganaa,
Lootaan, iyo Shoobaal, iyo Sibecoon, iyo Canah, 21 iyo
Dishon, iyo Eeser, iyo Diishaan. Kuwanu waa ugaasyadii
reer Xor, oo ahaa ilma Seciir oo degganaa dhulkii Edom. 22
Carruurtii Lootaanna waxay ahaayeen Xori iyo Heemaam,
Lootaan walaashiisna waxay ahayd Timnac. 23 Kuwanuna
waa carruurtii Shoobaal; Calwaan, iyo Maanahad, iyo
Ceebaal, iyo Shefo, iyo Oonaam. 24 Kuwanuna waa carruurtii
Sibecoon; Ayah, iyo Canah. Kanu waa Canah kii cidlada ka
helay ilaha biyaha oo kulul, markuu daajinayay dameerrada
aabbihiis Sibecoon. 25 Kuwanuna waa carruurtii Canah;
Dishon, iyo Aaholiibaamah, gabadhii Canah. 26 Kuwanuna
waa carruurtii Dishon; Xemdaan, iyo Eshbaan, iyo Yitraan,
iyo Keraan. 27 Kuwanuna waa carruurtii Eeser; Bilhaan, iyo
Sacwaan, iyo Caqaan. 28 Kuwanuna waa carruurtii Diishaan;
Cuus iyo Araan. 29 Kuwanuna waa ugaasyadii reer Xor;
ugaas Lootaan, iyo ugaas Shoobaal, iyo ugaas Sibecoon,
iyo ugaas Canah, 30 ugaas Dishon, iyo ugaas Eeser, iyo
ugaas Diishaan. Kuwanuna waa ugaasyadii reer Xor siday
ahaayeen ugaasyadoodii dalka Seciir joogay. 31 Kuwanuna
waa boqorradii xukumi jiray dalkii Edom intaan boqorna
xukumin reer binu Israa'iil. 32 Belac ina Becoor wuxuu xukumi
jiray Edom, magaaladiisii magaceedana waxaa la odhan
jiray Dinhaabah. 33 Markaasaa Belac dhintay, oo waxaa
meeshiisii xukumi jiray Yoobaab ina Serax oo reer Bosraah
ahaa. 34 Yoobaabna waa dhintay, oo waxaa meeshiisii
xukumi jiray Xushaam oo ka yimid dhulkii reer Teemaan.
35 Xushaamna waa dhintay, oo waxaa meeshiisii xukumi
jiray Hadad ina Bedad, oo reer Midyaan ku laayay berrinkii

Moo'aab, magaaladiisii magaceedana waxaa la odhan
jiray Cawiid. 36 Markaasaa Hadadna dhintay, oo waxaa
meeshiisii xukumi jiray Samlah oo reer Masreqah ahaa. 37
Markaasaa Samlahna dhintay, oo waxaa meeshiisii xukumi
jiray Sha'uul oo reer Rexobod ahaa oo webiga ag degganaa.
38 Markaasaa Sha'uulna dhintay, oo waxaa meeshiisii xukumi
jiray Bacal Xaanaan ina Cakboor. 39 Bacal Xaanaan ina
Cakboorna waa dhintay, oo waxaa meeshiisii xukumi jiray
Hadar, magaaladiisii magaceedana waxaa la odhan jiray
Faacuu; naagtiisa magaceeduna wuxuu ahaa Meheetabeel,
oo ay Matreed gabadha Meesaahaab dhashay. 40 Kuwanuna
waa magacyadii ugaasyadii Ceesaw dhalay, siday ahaayeen
qabiilooyinkoodii iyo magacyadii meelahoodii ay degganaan
jireen, waana ugaas Timnac, iyo ugaas Calwah, iyo ugaas
Yeteed, 41 iyo ugaas Aaholiibaamah, iyo ugaas Eelaah, iyo
ugaas Fiinon; 42 iyo ugaas Qenas, iyo ugaas Teemaan, iyo
ugaas Mibsaar; 43 iyo ugaas Magdii'eel, iyo ugaas Ciiraam.
Kuwanu waa ugaasyadii reer Edom sidii ay u degganaayeen
dhulkii ay lahaayeen. Kanu waa Ceesaw oo ahaa reer Edom
aabbahood.

**37** Yacquubna wuxuu degay dhulkii aabbihiis qariibka ku
ahaan jiray, oo ahaa dalkii Kancaan. 2 Kuwanuna waa
farcankii Yacquub. Yuusuf, isagoo jira toddoba iyo toban
sannadood, ayuu idaha la daajinayay walaalihiis, wuxuuna
ahaa wiil la jooga wiilashii Bilhah iyo Silfah oo ahaa naagihii
aabbihiis. Markaasuu Yuusuf xaggooda war xun uga keenay
aabbahood. 3 Israa'iilna Yuusuf wuu ka jeclaa carruurtiisa
oo dhan, maxaa yeelay, wuxuu ahaa inankuu dhalay markuu
gaboobay; oo wuxuuna u sameeyey shulug midabyo badan
leh. 4 Markaasaa walaalihiis arkeen in aabbahood ka jecel
yahay isaga walaalihiis oo dhan; kolkaasay nebcaadeen
isagii, wayna kari waayeen inay isaga si nabad ah ula
hadlaan. 5 Yuusufna wuu riyooday, markaasuu riyadiisii u
sheegay walaalihiis, iyana aad bay u sii nebcaadeen. 6 Oo
wuxuu iyagii ku yidhi, Waan idin baryayaaye, bal maqla
riyadan aan ku riyooday. 7 Bal eega, waxaynu beerta ku
xidhxidhaynay xidhmooyin, markaasaa xidhmadaydii kacday,
oo istaagtay, xidhmooyinkiinniina hareeraheeday yimaadeen
oo u sujuudeen xidhmadaydii. 8 Markaasaa walaalihiis ku
yidhaahdeen, Ma annagaad na xukumi doontaa? Amase noo
talin doontaa? Markaasay aad iyo aad ugu sii nebcaadeen
riyooyinkiisii iyo hadalladiisii aawadood. 9 Markaasuu
haddana riyo kale ku riyooday, oo walaalihiis u sheegay, oo
wuxuu ku yidhi, Bal eega, riyo kalaan ku riyoodaye. Waxaan
ku riyooday qorraxdii iyo dayaxii, iyo koob iyo toban xiddigood
oo ii sujuuday. 10 Markaasuu aabbihiis u sheegay, iyo
walaalihiisba, aabbihiisna waa canaantay, oo wuxuu ku yidhi,
Waa maxay riyadan aad ku riyootay? Ma aniga iyo hooyadaa
iyo walaalahaa baa kuu iman doonna, oo intaan wejiga
dhulka saarno kuu sujuudi doonna? 11 Markaasay walaalihiis
ka masayreen isagii; laakiinse aabbihiis maankuu ku haystay
hadalkii. 12 Markaasaa walaalihiis tageen, inay adhigii
aabbahood soo daajiyaan Shekem. 13 Israa'iilna wuxuu
Yuusuf ku yidhi, Miyaanay walaalahaa adhigii daajinayn
Shekem? Bal kaalay, xaggoodaan kuu dirayaaye. Markaasuu
isna ku yidhi, Waa i kan. 14 Oo wuxuu ku yidhi isagii,
Bal tag oo soo arag in walaalahaa iyo adhigiiba nabad
qabaan iyo in kale, oo haddana ii war keen. Sidaas
daraaddeed isagii wuxuu ka diray dooxadii Xebroon, oo
wuxuu tegey Shekem. 15 Markaasaa nin helay isagoo
duurka wareegaya; ninkiina wax buu weyddiiyey oo wuxuu
ku yidhi, Maxaad doondoonaysaa? 16 Isna wuxuu yidhi,
Waxaan doondoonayaa walaalahay. Waan ku baryayaaye, ii
sheeg meesha ay adhigii daajinayaan. 17 Markaasaa ninkii
ku yidhi, Halkan way ka tageen, waayo, waxaan maqlay
iyagoo isku leh, Ina keena aynu Dotaan tagnee. Markaasuu
Yuusuf walaalihiis ka daba tegey, oo wuxuu iyagii ka helay
Dotaan. 18 Markaasay meel fog ka arkeen isagii, oo intuusan
u soo dhowaan iyagii, ayay ku tashadeen inay dilaan. 19 Oo
waxay isku yidhaahdeen, Bal eega, kii riyada badnaa waa
soo socdaaye. 20 Haddaba kaalaya aynu dilnee, oo aynu
ku tuurno ceelasha midkood, oo waxaynu odhan doonnaa,
Bahal xun baa cunay. Dabadeedna waxaynu arki doonnaa
bal waxay riyooyinkiisii noqdaan. 21 Oo Ruubeen baa
taas maqlay, isagiina wuu ka samatabbixiyey gacantoodii;
oo wuxuu iyagii ku yidhi, Yeynan naftiisa ka qaadin. 22
Kolkaasaa Ruubeen ku yidhi iyagii, Dhiig ha daadinina, ee
isaga ku tuura ceelkan cidlada ku yaal, laakiinse far ha
saarina. Oo wuxuu taas u yeelay inuu isaga ka samatabbixiyo
gacantooda oo uu u celiyo aabbihiis. 23 Oo waxay noqotay
in markii Yuusuf walaalihiis u yimid ay Yusuuf ka furteen
shuluggiisii, kaasu wuxuu ahaa shuluggii midabyada badnaa
oo uu qabay. 24 Kolkaasay qabteen oo ay ceelkii ku tuureen;
ceelkuna waa madhnaa oo biyo kuma jirin. 25 Kolkaasay
u fadhiisteen inay wax cunaan; dabadeedna indhahay kor
u taageen oo wax bay fiiriyeen, oo waxay arkeen safar
reer Ismaaciil ah oo ka soo socda xagga Gilecaad, oo
awrtooda ay ugu raran yihiin xawaash, iyo beeyo, iyo
malmal, waxayna u socdeen xagga Masar. 26 Markaasuu
Yahuudah ku yidhi walaalihiis, Maxaa faa'iido inoogu jirta,
haddaynu walaalkeen dilno oo aynu dhiiggiisa qarinno? 27
Kaalaya, aynu reer Ismaaciil ka iibinnee, oo yeynan isaga
far saarin, maxaa yeelay, isagu waa walaalkeen, waana

jidhkeenna. Walaalihiisna way maqleen isagii. 28 Oo waxaa
ag maray niman reer Midyaan ah, oo baayacmushtariyaal
ah. Markaasay Yuusuf soo jiideen oo ceelkii ka soo bixiyeen,
oo waxay Yuusuf kuwii reer Ismaaciil kaga iibiyeen labaatan
xabbadood oo lacag ah. Oo iyana Yuusuf waxay keeneen
Masar. 29 Markaasaa Ruubeen ku noqday ceelkii; wuxuuna
arkay inuusan Yuusuf ku jirin ceelka, kolkaasuu dharkiisii
dildillaaciyey. 30 Markaasuu walaalihiis ku noqday, oo wuxuu
ku yidhi, Yarkii ma joogo, haddaba anigu xaggee baan
tagaa? 31 Kolkaasay shuluggii Yuusuf qaadeen oo intay orgi
gowraceen ayay shuluggii dhiiggii geliyeen. 32 Markaasay
shuluggii midabyada badnaa direen, oo ay aabbahood u
keeneen; oo waxay ku yidhaahdeen, Kan waannu helnay,
haddaba bal garo inuu shuluggii wiilkaagii yahay iyo in kale.
33 Wuuna gartay, oo wuxuu yidhi, Waa shuluggii wiilkayga.
Bahal xun baa cunay isagii. Shakila'aan Yuusuf cadcad
baa loo kala jeexjeexay. 34 Markaasaa Yacquub dharkiisii
dildillaaciyey, oo joonyad buu dhexda ku xidhay, wiilkiisiina
maalmo badan ayuu u barooranayay. 35 Kolkaasaa wiilashiisii
oo dhan iyo gabdhihiisii oo dhammu u kaceen inay isaga
qalbi qaboojiyaan, laakiinse wuu diiday inuu qalbi qaboobo,
oo wuxuu yidhi, Anigoo barooranaya ayaan qabriga geli
doonaa oo wiilkaygii u tegi doonaa. Aabbihiisna wuu u ooyay
isagii. **(Sheol h7585)** 36 Markaasay kuwii reer Midyaan isagii
Masar kaga iibiyeen nin la odhan jiray Footiifar, wuxuuna
ahaa sirkaalkii Fircoon oo ahaa madaxa waardiyayaasha.

**38** Oo waagaas waxay noqotay inuu Yahuudah ka tegey
walaalihiis, oo wuxuu u leexday nin magiciisa la
odhan jiray Xiirah oo reer Cadullaam ah. 2 Markaasaa
Yahuudah wuxuu halkaas ku arkay nin reer Kancaan ah
oo magiciisa la odhan jiray Shuuca gabadhiisii. Kolkaasuu
kaxaystay iyadii oo uu u tegey. 3 Wayna uuraysatay oo
waxay dhashay wiil, magiciisiina wuxuu u bixiyey Ceer. 4
Oo haddana mar kalay uuraysatay oo waxay dhashay wiil;
magiciisiina waxay u bixisay Oonaan. 5 Oo weliba haddana
wiil kalay dhashay, magiciisiina waxay u bixisay Sheelaah;
oo isna wuxuu joogay Kesiib, markay dhashay isaga. 6
Markaasaa Yahuudah naag u guuriyey curadkiisii ahaa Ceer,
magaceedana waxaa la odhan jiray Taamaar. 7 Yahuudah
curadkiisii ahaa Ceer waa ku xumaa Rabbiga hortiisa;
Rabbiguna waa dilay isagii. 8 Markaasaa Yahuudah wuxuu
ku yidhi Oonaan, Naagta walaalkaa u tag oo dumaal, oo ku
samee wixii ninkeeda walaalkiis ku samayn lahaa, oo farcan
u reeb walaalkaa. 9 Oonaanna wuu ogaa inaan farcanku
kiisii noqonayn, oo markuu u tegey naagtii walaalkiis ayuu
shahwadiisii ku daadiyey dhulka, si uusan farcan u siin
walaalkiis. 10 Wixii uu sameeyeyna Rabbiga hortiisa aad
buu ugu xumaa; oo markaasuu isagiina dilay. 11 Markaasuu
Yahuudah ku yidhi gabadhii Taamaar oo uu soddogga
u ahaa, Carmalnimo ku joog guriga aabbahaa, ilaa uu
wiilkayga Sheelaah koro; waayo, wuxuu isyidhi, Waaba
intaasoo uu isna dhintaa sidii walaalihiis. Kolkaasay Taamaar
tagtay oo gurigii aabbeheed joogtay. 12 Wakhti dheer ka
dib waxaa dhimatay Shuuca gabadhiisii oo ahayd naagtii
Yahuudah. Markaasaa Yahuudah loo tacsiyeeyey, oo wuxuu
tegey xagga kuwii idihiisa dhogorta ka xiiri jiray oo joogay
Timnaad, isaga iyo saaxiibkiis Xiirah kii reer Cadullaamba. 13
Markaasaa Taamaar loo sheegay, oo waxaa lagu yidhi, Bal
eeg, soddoggaa wuxuu tegayaa xagga Timnaad inuu idihiisii
dhogorta ka soo xiirto. 14 Markaasay iska dhigtay dharkii
carmalinimadeeda, oo waxay hagoogatay indhashareerteedii,
oo intay isdedday ayay waxay fadhiisatay iriddii Cenayim, oo
ku ag tiil jidka loo maro Timnaad, waayo, waxay aragtay
inuu Sheelaah weynaaday, oo aan loo guurin iyada. 15
Markii Yahuudah arkay ayuu u maleeyey inay dhillo tahay;
maxaa yeelay, wejigeeday qarisay. 16 Kolkaasuu ku soo
leexday iyadoo jidka ag fadhida, oo wuxuu ku yidhi, Waan
ku baryayaaye, kaalay aan kuu tagee; waayo, ma uu ogayn
inay tahay gabadhii uu soddogga u ahaa. Kolkaasay waxay
ku tidhi, Maxaad i siinaysaa aad ii tagtide? 17 Markaasuu
wuxuu ku yidhi, Waxaan adhiga kaaga soo diri doonaa
waxar. Iyana waxay tidhi, Rahaamad ma i siinaysaa intaad ii
soo diraysid? 18 Isna wuxuu yidhi, Maxaan rahaamad kuu
siiyaa? Kolkaasay tidhi, I sii kaatunkaaga iyo xadhiggaaga,
iyo ushaada aad gacanta ku haysatid. Kolkaasuu siiyey,
oo uu u tegey iyadii, oo iyana xaggiisay ka uuraysatay. 19
Kolkaasay kacday oo tagtay, oo intay indhashareerteedii
iska dhigtay, ayay xidhatay dharkii carmalinimadeedii. 20
Markaasaa Yahuudah waxar adhiga ka soo diray oo wuxuu
ugu soo dhiibay gacanta saaxiibkiis kii reer Cadullaam, inuu
rahaamaddii ka soo qaado gacantii naagta, laakiinse iyadii
wuu waayay. 21 Markaasuu weyddiiyey dadkii degganaa
meesheedii, oo wuxuu ku yidhi, Meeday dhilladii joogi jirtay
Cenayim jidka dhinaciisa? Kolkaasay iyana ku yidhaahdeen,
Halkan dhillo ma joogi jirin. 22 Markaasuu ku noqday
Yahuudah, oo wuxuu ku yidhi, Iyadii waan waayay, dadkii
meeshaa degganaana waxay igu yidhaahdeen, Halkan
dhillo ma joogi jirin. 23 Markaasaa Yahuudah yidhi, Ha iska
qaadato, waaba intaasoo aynu ku ceebownaaye; waayo,
bal eeg, anigu waxaan u diray waxarkan, waana aad soo
weyday iyadii. 24 Oo waxay noqotay in muddo saddex bilood
ku dhow dabadeed Yahuudah war loo soo sheegay, oo
lagu yidhi, Gabadhii Taamaar oo aad soddogga u ahayd

waa dhillowday; oo dhillanimadeedii bay ku uuraysatay.
Markaasaa Yahuudah yidhi, Soo bixiya oo ha la gubo. **25**
Kolkaasay markii la soo bixiyey farriin u dirtay soddoggeed,
oo waxay tidhi, Ninka alaabtan leh ayaa i uureeyey; oo
waxay kaloo tidhi, Waan ku baryayaaye, bal hubso ninka leh
kuwan ah kaatunka iyo xadhkaha, iyo usha. **26** Markaasaa
Yahuudah qirtay iyagii, oo wuxuu yidhi, Iyadu way iga xaqsan
tahay, waayo, waxaan iyada siin waayay wiilkayga Sheelaah
ah. Mar dambena uma uu tegin iyadii. **27** Oo bal eeg,
markii ay foolatay mataano baa ku jiray maxalkeeda. **28** Oo
waxay noqotay, in markii ay foolatay uu midkood gacan soo
bixiyey; markaasay umulisadii qaadatay dun guduudan oo ay
gacantiisii ku xidhay, oo waxay tidhi, Kanaa soo hor baxay.
**29** Oo waxay noqotay, markuu gacanta dib u ceshaday, inuu
walaalkiis soo baxay; oo iyana waxay tidhi, De maxaad u
soo dustay? Sidaas daraaddeed magiciisii waxaa loo bixiyey
Feres. **30** Dabadeedna waxaa soo baxay walaalkiis, kii ay
dunta guduudanu gacanta ugu xidhnayd; magiciisiina waxaa
loo bixiyey Serax.

**39** Yuusufna waxaa la keenay Masar. Kuwii reer Ismaaciil
oo isaga halkaas geeyeyna waxaa gacantoodii ka
iibsaday nin Masri ahaa oo la odhan jiray Footiifar, oo
Fircoon sirkaal u ahaa, oo madaxii waardiyayaasha ahaa. **2**
Rabbiguna waa la jiray Yuusuf, wuxuuna ahaa nin liibaansan,
wuxuuna joogi jiray gurigii sayidkiisii Masriga ahaa. **3**
Sayidkiisiina wuu arkay in Rabbigu liibaaniyey wixii uu
sameeyey oo dhan. **4** Isaguna raalli buu Yuusuf ka ahaa,
Yuusufna waa u adeegi jiray, oo wuxuu isagii ka dhigay kan
gurigiisa u sarreeya, wixii uu haystay oo dhanna gacantiisuu
wada geliyey. **5** Oo waxay noqotay in wakhtigii uu ka
dhigay kan u sarreeya gurigiisa iyo wixii uu haystay oo
dhan, uu Rabbigu gurigii kii Masriga ahaa u barakeeyey
Yuusuf aawadiis, wixii uu guriga iyo beertaba ku haystay
oo dhanna barakada Rabbigaa saarnayd. **6** Wixii uu lahaa
oo dhanna Yuusuf gacantiisuu kaga tegey. Waxbana kama
ogayn wixii uu hayay, wixii uu cuni jiray mooyaane. Yuusufna
aad buu u quruxsanaa, wuuna suurad wanaagsanaa. **7** Oo
waxay noqotay waxyaalahaas ka dib in naagtii sayidkiisu ay
fiirisay Yuusuf, oo ay ku tidhi, Kaalay ila jiifso. **8** Laakiinse
wuu diiday, oo wuxuu ku yidhi naagtii sayidkiisa, Bal eeg,
sayidkaygu waxba kama oga waxa aan guriga ku hayo;
wixiisii oo dhanna gacantayduu wada geliyey; **9** oo weliba
gurigan mid aniga iga weynu ma joogo, oo isaguna waxba
igalama hadhin adiga mooyaane, maxaa yeelay, adigu
waxaad tahay naagtiisii, de haddaba sidee baan u samayn
karaa xumaantan weyn, oo aan Ilaah ugu dembaabaa?
**10** Oo waxay noqotay, in kastoo ay maalinba maalinta ka
dambaysa la hadlaysay Yuusuf, inuu maqli waayay inuu
la jiifsado ama uu la joogo iyadii. **11** Oo waxay noqotay
haddaa oo kale, inuu gurigii galay inuu shuqulkiisii qabsado,
nimankii gurigana midna gudaha ma joogin. **12** Kolkaasay
qabsatay dharkiisii, oo waxay ku tidhi, Ila jiifso. Isaguse
dharkiisii gacanteeduu kaga tegey, wuuna cararay oo baxay.
**13** Markay aragtay inuu dharkiisii gacanteeda kaga tegey, oo
uu dibadda u cararay, **14** ayay u yeedhay raggii gurigeeda oo
ay la hadashay, oo waxay ku tidhi, Bal eega, ninkaygu wuxuu
inoo keenay nin Cibraani ah inuu inagu majaajiloodo. Wuxuu
iigu soo galay inuu ila jiifsado aawadeed, markaasaan cod
dheer ku qayliyey, **15** oo markuu maqlay inaan codkaygii
sare u qaaday oo aan qayliyey ayuu dharkiisii iiga tegey,
wuuna cararay oo baxay. **16** Dharkiisiina way is-ag dhigtay
ilaa uu sayidkiisii guriga yimid. **17** Kolkaasay hadalkan kula
hadashay isagii, oo waxay ku tidhi, Addoonkii Cibraaniga
ahaa, oo aad inoo keentay, ayaa iigu soo galay inuu igu
majaajiloodo, **18** oo markaan codkaygii sare u qaaday oo
aan qayliyey ayuu dharkiisii iiga tegey, oo uu dibadda u
cararay. **19** Markii sayidkiisii maqlay hadalkii naagtiisa, oo
ay kula hadashay isaga, iyadoo leh, Addoonkaagii sidan
buu igu sameeyey, ayuu cadhooday. **20** Markaasaa Yuusuf
sayidkiisii qabtay isagii, oo wuxuu geliyey xabsigii ahaa
meeshii maxaabiista boqorku ku xidhnaayeen; oo isna
halkaasuu ku jiray xabsigii gudihiisa. **21** Laakiinse Yuusuf
waxaa la jiray Rabbiga, wuuna u roonaaday, kii xabsiga
hayayna raalli buu uga dhigay. **22** Kii xabsiga hayayna wuxuu
Yuusuf gacanta u geliyey maxaabiistii xabsiga ku jirtay oo
dhan; oo wax kastoo ay halkaas ku sameeyeenna, wuxuu
ahaa kii sameeyey. **23** Kii xabsiga hayayna ma uu eegi jirin
waxa isaga gacantiisa ku jira, maxaa yeelay, Rabbigaa la
jiray isaga, wixii uu sameeyeyna Rabbigu waa liibaaniyey.

**40** Waxyaalahaas ka dib, kii boqorkii Masar khamriga
siin jiray iyo kii wax u dubi jiray waxay xumeeyeen
sayidkoodii ahaa boqorkii Masar. **2** Fircoonna aad buu ugu
cadhaysnaa labadiisii sirkaal oo ahaa kii madaxa u ahaa
kuwii khamriga siin jiray, iyo kii madaxa u ahaa kuwii wax u
dubi jiray. **3** Oo wuxuu iyagii ku xabbisay gurigii madaxa
waardiyayaasha, xagga xabsiga gudihiisa oo ahaa meeshii
Yuusuf ku xidhnaa. **4** Madaxii waardiyayaashuna Yuusuf
amar buu u siiyey iyagii, wuuna u adeegi jiray iyagii; intii
wakhti ahna xabsigay ku jireen. **5** Kii khamriga siin jiray iyo kii
wax u dubi jiray boqorkii Masar, iyagoo xabsiga ku xidhnaa,
ayay labadoodiiba isku habeen riyoodeen, nin kastaana
riyadiisuu ku riyooday oo nin kastaa wuxuu ku riyooday

sidii riyadiisii fasirkeedu ahaa. 6 Subaxdii baa Yuusuf u
soo galay oo fiiriyey iyagii, oo wuxuu arkay iyagoo calool
xun. 7 Markaasuu wax weyddiiyey saraakiishii Fircoon oo
isaga lagula xabbisay guriga sayidkiisa, oo wuxuu ku yidhi,
Maxaad maanta ugu eg tihiin kuwo calool xun? 8 Markaasay
waxay ku yidhaahdeen isagii, Riyaannu ku riyoonnay, mana
jiro mid fasiri karaa. Markaasaa Yuusuf wuxuu ku yidhi iyagii,
Miyaan Ilaah fasirro lahayn? Haddaba waan idin baryayaaye,
bal ii sheega. 9 Markaasaa madaxii kuwii khamriga keeni
jiray riyadiisii Yuusuf u sheegay, oo wuxuu yidhi, Riyadaydii
waxaan ku arkay geed canab ah oo i hor yaal. 10 Geedkuna
wuxuu lahaa saddex laamood. Waxayna u ekaayeen sidii
iyagoo magoolaya, ubaxyadiina soo baxayaan; markaasaa
rucubyadii waxay noqdeen canab bisil. 11 Koobkii Fircoonna
gacantayduu ku jiray, markaasaan canabkii guray oo koobkii
Fircoon ku tuujiyey, koobkiina waxaan u dhiibay gacantii
Fircoon. 12 Markaasaa Yuusuf ku yidhi, Fasirkeedii waa kan:
saddexda laamood waa saddex maalmood. 13 Oo weliba
saddex maalmood dhexdooda ayaa Fircoon madaxaaga kor
u qaadi doonaa, oo meeshaaduu kugu celin doonaa; Fircoon
koobkiisiina gacantiisaad u dhiibi doontaa sidii waagii hore
markaad ahaan jirtay kii khamriga siin jiray. 14 Laakiinse
waan ku baryayaaye, i soo xusuuso markay kuu hagaagto,
oo ii roonow, oo Fircoon ii sheeg, oo gurigan iga bixi; 15
waayo, waxaa layga soo xaday dhulka Cibraaniyada, oo
halkanna kuma aan samayn wax ay iigu ridaan godxabsiga.
16 Madaxii kuwii wax dubi jiray markuu arkay inuu fasirkaasu
wanaagsanaa ayuu wuxuu Yuusuf ku yidhi, Aniguna waxaan
riyadaydii ku arkay saddex dambiil oo kibis cadcadu ku
jirto oo madaxayga saaran. 17 Oo dambiishii ugu wada
sarreeyey waxaa ku jiray cunto cayn kasta ah oo Fircoon loo
dubay; markaasay haadkii cuntadii ka cuneen dambiishii
madaxayga saarnaa. 18 Markaasaa Yuusuf u jawaabay oo
ku yidhi, Fasirkeedii waa kan; saddexda dambiil waa saddex
maalmood. 19 Oo weliba saddex maalmood dhexdooda
ayaa Fircoon madaxaaga kor kaaga qaadi doonaa, geed
buuna kaa soo deldeli doonaa, markaasaa haadku hilibkaaga
cuni doonaa. 20 Maalintii saddexaad oo la xusuustay
maalintii Fircoon dhashay ayuu addoommadiisii oo dhan
diyaafad u sameeyey; markaasuu kor u qaaday madaxii kii
madaxa u ahaan jiray kuwii khamriga isaga siin jiray iyo
madaxii kii madaxa u ahaan jiray kuwii wax u dubi jiray oo
addoommadiisa dhex joogay. 21 Markaasuu madaxii kuwii
khamriga keeni jiray mar kale shaqadiisii ku celiyey; oo
koobkii buu u dhiibay gacantii Fircoon; 22 laakiinse madaxii
kuwii wax dubi jiray ayuu deldelay sidii Yuusuf ugu fasiray
iyaga. 23 Laakiinse madaxii kuwii khamriga keeni jiray ma
uu xusuusan Yuusuf, wuuse illoobay isagii.

41 Markii laba sannadood oo dhammu dhammaatay ayuu
Fircoon riyooday, oo wuxuu is-arkay isagoo webiga ag
taagan. 2 Oo bal eeg, waxaa webigii ka soo baxay toddoba
sac oo quruxsan oo cayillan, oo waxay daaqeen cawskii
dareemada ahaa. 3 Markaasaa waxaa dabadood webigii
ka soo baxay toddoba sac oo kale oo fool xun, oo weyd
ahaa, oo waxay is-ag taageen sicihii kale oo webiga qarkiisa
jooga. 4 Markaasaa sicihii foosha xumaa oo weydda ahaa
waxay cuneen toddobadii sac oo qurxoonayd oo cayillanayd.
Kolkaasuu Fircoon toosay. 5 Markaasuu haddana seexday
oo mar labaad riyooday, oo wuxuu arkay toddoba sabuul oo
buurbuuran oo wanaagsan oo ka soo baxay isku jirid. 6
Oo bal eeg, waxaa haddana ka soo daba baxay toddoba
sabuul oo xunxun, oo ay dabayshii bari qallajisay. 7
Markaasaa sabuulladii xunxumaa waxay liqeen toddobadii
sabuul oo buurbuurnayd oo iltirnayd. Markaasuu Fircoon
toosay, oo wuxuu arkay inay riyo tahay. 8 Oo subaxdiina wuu
dhibaataysnaa, kolkaasuu u cid diray oo uu u wada yeedhay
saaxiriintii Masar oo dhan iyo nimankii xigmadda lahaa oo
dhan; markaasaa Fircoon u sheegay riyadiisii; laakiin ma
jirin mid Fircoon u fasiri karaa. 9 Markaasaa waxaa Fircoon
la hadlay kii madaxa u ahaa kuwa khamriga siin jiray isaga,
oo wuxuu ku yidhi, Maantaan xusuustay dembiyadaydii. 10
Fircoonow, adigoo u cadhaysnaa addoommadaada, waxaad
igu xabbistay guriga madaxa waardiyayaasha, oo waxaannu
ahayn aniga iyo kii madaxa u ahaa kuwii wax dubi jiray; 11
oo markaasaannu isku habeen riyoonnay, aniga iyo isagiiba;
waxaannu ku riyoonnay midkayo kastaba sidii riyadiisii
fasirkeedu ahaa. 12 Oo halkaasna waxaa nala joogay nin
dhallinyaro ah oo Cibraani ah, oo madaxa waardiyayaasha
addoon u ahaa, markaasaannu isagii u sheegnay, oo isna
wuu noo fasiray riyooyinkayagii, nin kastana sidii riyadiisu
ahayd buu ugu fasiray. 13 Oo sidii uu noogu fasiray ayay
noqotay. Aniga waxaa laygu soo celiyey meeshaydii, isagiina
waa la deldelay. 14 Dabadeedna Fircoon baa u cid diray oo
u yeedhay Yuusuf. Markaasay dhaqso uga soo bixiyeen
godxabsigii; kolkaasuu xiirtay, oo dharkiisii beddeshay, oo uu
u soo galay Fircoon. 15 Markaasaa Fircoon wuxuu Yuusuf
ku yidhi, Riyaan ku riyooday, mana jiro mid fasiri karaa;
oo waxaan maqlay in markii aad riyo maqashid aad fasiri
kartid. 16 Yuusufna Fircoon buu u jawaabay oo ku yidhi,
Taasu xaggayga ma aha, laakiinse Ilaah wuxuu Fircoon siin
doonaa jawaab nabadeed. 17 Markaasaa Fircoon Yuusuf la
hadlay, oo yidhi, Waxaan riyadaydii ku arkay anigoo webiga

qarkiisa taagan; 18 oo bal eeg, waxaa webigii ka soo baxay
toddoba sac oo buurbuuran oo quruxsan oo waxay daaqeen
cawskii dareemada ahaa; 19 oo waxaa haddana ka soo
daba baxay toddoba sac oo kale, oo taagdaran oo fool xun
oo weyd ah. Weligay dhulka Masar oo dhan kuma aan arag
kuwa sidooda u xun. 20 Markaasaa sicihii weydda ahaa oo
foosha xumaa waxay cuneen toddobadii sac oo hore. 21 Oo
markay cuneen lagama garan karin inay cuneen, laakiinse
waxay u fool xumaayeen sidii markii hore. Markaasaan
toosay. 22 Oo waxaan kaloo riyadaydii ku arkay toddoba
sabuul oo iltiran oo wanaagsan, oo ka soo baxay isku jirid;
23 dabadeedna waxaa ka soo daba baxay toddoba sabuul
oo engegan oo xunxun oo dabayshii bari qallajisay. 24
Markaasaa sabuulladii xunxumaa waxay liqeen toddobadii
sabuul oo wanaagsanayd; markaasaan u sheegay saaxiriinta,
laakiinse ma uu jirin mid ii sheegi karay. 25 Oo Yuusuf
wuxuu ku yidhi Fircoon, Riyadaadu waa mid, oo waxa Ilaah
samaynayo ayuu kuu sheegay, Fircoonow. 26 Toddobada sac
oo wanwanaagsanu waa toddoba sannadood, toddobada
sabuul oo wanwanaagsanuna waa toddoba sannadood;
riyadu waa mid. 27 Toddobada sac oo weyd ah oo foosha
xun, oo ka soo daba baxay waa toddoba sannadood, oo
haddana toddobada sabuul oo madhan, oo dabayshii bari
qallajisay waxay noqon doonaan toddoba sannadood oo
abaar ah. 28 Taasu waa wixii aan kugula hadlay, Fircoonow.
Waxa Ilaah samaynayo ayuu ku tusay. 29 Oo bal eeg,
waxaa dalka Masar oo dhan imanaya toddoba sannadood oo
barwaaqo ah, 30 oo dabadoodna waxaa dhici doona toddoba
sannadood oo abaar ah; oo barwaaqadii oo dhanna waa
laga illoobi doonaa dalka Masar, markaasay abaartu dhulka
dhammayn doontaa, 31 barwaaqadana dhulka laguma ogaan
doono abaartaas ka dambaysa aawadeed, waayo, waxay
noqon doontaa mid aad u xun. 32 Oo taas aawadeed
riyadii labanlaab bay kuu noqotay, Fircoonow, maxaa yeelay,
waxaas waxaa amray Ilaah, oo weliba Ilaah dhowaan buu
samayn doonaa. 33 Haddaba Fircoonow, waxaad doontaa
nin caqli iyo xigmad leh, oo u sarraysii dalka Masar oo dhan.
34 Tan yeel oo waxaad doorataa niman dalka u sarreeya,
oo waxa toddobada sannadood oo barwaaqada ah dhulka
ka baxa inta shanaad ha ururiyeen. 35 Oo cuntada oo
dhan sannadahan wanaagsan oo imanaya ha ururiyeen,
hadhuudhkana ha kugu hoos kaydiyeen, Fircoonow, oo intay
cunto ahaan magaalooyinka u dhigaan, ha ilaaliyeen. 36
Cuntaduna kayd bay dalka u noqon doontaa toddobada
sannadood oo abaarta ah oo ka dhici doonta dalka Masar, si
aan dalku abaarta ugu baabbi'in. 37 Waxaasuna Fircoon
way la wanaagsanaayeen, isaga iyo addoommadiisiiba. 38
Markaasaa Fircoon wuxuu addoommadiisii ku yidhi, Miyaynu
heli karaynaa mid la mid ah kan, oo ah nin Ruuxa Ilaah ku
jiro? 39 Markaasuu Fircoon wuxuu Yuusuf ku yidhi, Mar
haddii Ilaah ku tusay waxyaalahan oo dhan, ma jiro mid
sidaadoo kale caqli iyo xigmad u leh. 40 Adigu waxaad ka
sarrayn doontaa gurigayga, dadkayga oo dhanna waxaa lagu
xukumi doonaa si waafaqsan hadalkaaga, oo anigu carshiga
oo keliya ayaan kaaga weynaan doonaa. 41 Markaasaa
Fircoon wuxuu Yuusuf ku yidhi, Bal eeg, dalka Masar oo dhan
ayaan kaa sarraysiiyey. 42 Markaasuu Fircoon gacantiisa ka
bixiyey kaatunkiisii, oo Yuusuf gacanta u geliyey, oo wuxuu u
xidhay dhar aad u wanaagsan, silsilad dahab ahna qoortuu u
sudhay; 43 oo wuxuu fuushiiyey gaadhifaraskii labaad oo uu
lahaa, oo waxay hortiisa kaga qayliyeen, Sujuuda; oo wuxuu
ka sarraysiiyey dalka Masar oo dhan. 44 Markaasaa Fircoon
wuxuu Yuusuf ku yidhi, Anigu waxaan ahay Fircoon, oo adiga
la'aantaa ninna gacantiisa ama cagtiisa kor uma qaadi doono
dalka Masar oo dhan. 45 Markaasaa Fircoon wuxuu Yuusuf
magiciisii u bixiyey Saafnad Facneh, oo wuxuu u guuriyey
Aasenad oo ahayd ina Footiiferac, wadaadkii Oon. Yuusufna
markaasuu dalkii Masar oo dhan u baxay oo wada maray. 46
Yuusufna soddon sannadood buu jiray markuu hor istaagay
Fircoon oo ahaa boqorkii Masar. Markaasaa Yuusuf Fircoon
hortiisii ka tegey, oo wuxuu wada maray dalkii Masar oo
dhan. 47 Markaasaa toddobadii sannadood oo barwaaqada
ahayd waxaa dhulkii ka soo baxay wax aad u badan. 48
Markaasuu ururiyey cuntadii toddobadii sannadood baxday
oo dalka Masar oo dhan tiil, oo cuntadii wuxuu ku kaydiyey
magaalooyinka. Cuntadii beerihii ku wareegsanaa magaalo
kastana isku meel buu ku kaydiyey. 49 Markaasaa Yuusuf
hadhuudh aad u badan wuxuu u kaydiyey sida cammuudda
badda, ilaa uu tirintii daayay, maxaa yeelay, waxay ahayd
wax aan tiro lahayn. 50 Oo Yuusuf waxaa u dhashay laba
wiil intii aan sannaddii abaarta ahayd iman, oo waxaa
u dhashay Aasenad oo ahayd ina Footiiferac, wadaadkii
Oon. 51 Markaasaa Yuusuf wuxuu curadkii magiciisii u
bixiyey Manaseh; waayo, wuxuu yidhi, Ilaah waa i illowsiiyey
dhibaatadaydii oo dhan, iyo gurigii aabbahay oo dhan. 52 Kii
labaadna magiciisii wuxuu u bixiyey Efrayim. Waayo, wuxuu
yidhi, Ilaah waa igu badiyey dalkii aan ku dhibtooday. 53
Markaasaa toddobadii sannadood oo barwaaqada ahayd ay
dalkii Masar ka dhammaadeen. 54 Oo waxaa bilaabatay
toddobadii sannadood oo abaarta ahayd, sidii Yuusuf yidhi.
Dalalkii oo dhanna abaar baa ka dhacday; laakiinse dalka
Masar oo dhan cuntaa jirtay. 55 Oo markii dalkii Masar oo
dhammu wada abaarsaday ayaa dadkii Fircoon cunto ugu
qayliyeen. Markaasaa Fircoon wuxuu ku yidhi Masriyiintii oo

dhan, Yuusuf u taga, oo wuxuu idin yidhaahdo yeela. 56
Oo abaartuna waxay ka dhacday dhulka dushiisa oo dhan.
Markaasaa Yuusuf wada furay maqsinnadii oo dhan, oo
wuxuu hadhuudhkii ka iibiyey Masriyiintii, abaartuna aad bay
ugu xumayd dalka Masar. 57 Markaasaa dalalkii oo dhammu
waxay u soo safreen Masar, oo Yuusuf bay ugu yimaadeen
inay hadhuudh ka iibsadaan; maxaa yeelay, abaartu aad bay
ugu xumayd dhulka oo dhan.

**42** Haddaba Yacquub wuxuu arkay in hadhuudh laga helo
Masar, markaasuu Yacquub wiilashiisii ku yidhi, War
maxaa midkiinba midka kale u fiirinayaa? 2 Oo wuxuu yidhi,
Bal ogaada, waxaan maqlay in hadhuudh laga helo Masar.
Bal xaggaas u dhaadhaca, oo halkaas wax inooga soo iibiya,
inaynu noolaanno oo aynaan dhimanin. 3 Markaasaa Yuusuf
tobankiisii walaal waxay u tageen Masar inay hadhuudh
ka soo iibsadaan. 4 Laakiinse Benyaamiin oo ahaa Yuusuf
walaalkiis Yacquub ma uu raacinin walaalihiis; waayo, wuxuu
isyidhi, Waaba intaasoo belaayo ku dhacdaa. 5 Markaasaa
wiilashii Israa'iil waxay u yimaadeen inay wax iibsadaan,
iyagoo la socda kuwii yimid, waayo, abaartu dalkii Kancaanna
way ka dhacday. 6 Yuusufna wuxuu ahaa taliyihii dalka,
isaguna wuxuu ahaa kii wax ka iibin jiray dadka dalka oo
dhan. Markaasay Yuusuf walaalihiis u yimaadeen isagii, oo
intay u wada sujuudeen ayay wejiga dhulka wada saareen.
7 Yuusufna walaalihiis wuu arkay, wuuna gartay, laakiin
wuxuu isaga dhigay sidii nin qalaad, oo intuu si qallafsan ula
hadlay ayuu wuxuu ku yidhi iyagii, War xaggee baad ka
timaadeen? Oo iyana waxay yidhaahdeen, Waxaannu ka
nimid dalka Kancaan si aannu cunto u iibsanno. 8 Yuusufna
wuu gartay walaalihiis laakiinse iyagu ma ay garan isagii. 9
Markaasaa Yuusuf xusuustay riyooyinkii iyaga ku saabsanaa
oo uu ku riyooday, oo wuxuu ku yidhi iyagii, Basaasyaad
tihiin, oo waxaad u timaadeen inaad aragtaan dhulka
abaarnimadiisa. 10 Iyana waxay ku yidhaahdeen isagii,
Maya, sayidkayagiiyow, laakiinse annagoo addoommadaada
ah waxaannu u nimid inaannu cunto iibsanno. 11 Kulligayo
isku nin wiilashiis baannu nahay, oo waxaannu nahay niman
daacad ah, oo annagoo addoommadaada ah basaasyo ma
nihin. 12 Oo isna wuxuu ku yidhi iyagii, Maya, laakiinse
waxaad u timaadeen inaad aragtaan dhulka abaarnimadiisa.
13 Iyana waxay yidhaahdeen, Annagoo ah addoommadaada
waxaannu nahay laba iyo toban walaalo ah, oo waxaannu
nahay nin jooga dalka Kancaan wiilashiisii; oo bal eeg, kii
noogu yaraa wuxuu maanta la joogaa aabbahayo, midna
maba joogo. 14 Markaasuu Yuusuf iyagii ku yidhi, Taasu
waa tii aan idinkula hadlay, anigoo leh, Basaasyaad tihiin.
15 Haddaba tan baa laydinku tijaabin doonaa; nolosha
Fircoon baan ku dhaartay inaydaan halkan ka tegi doonin,
in walaalkiinnii yaraa halkan yimaado mooyaane. 16 Mid
idinka mid ah dira, oo ha keeno walaalkiin, idinkuna waad
xidhnaan doontaan, in la tijaabiyo hadalkiinna, bal inay runi
idinku jirto iyo in kale, haddii kalese hubaal nolosha Fircoon
baan ku dhaartay inaad basaasyo tihiin. 17 Markaasuu
kulligood muddo saddex maalmood ah wada xabbisay.
18 Kolkaasaa maalintii saddexaad Yuusuf iyagii ku yidhi,
Tan yeela, oo waad noolaan doontaan, waayo, anigu Ilaah
baan ka cabsadaa. 19 Haddaad niman daacad ah tihiin,
walaalihiinna midkood ha ku xidhnaado guriga xabsigiinna;
laakiinse idinku taga, oo hadhuudh u geeya reerihiinna
abaaraysan. 20 Walaalkiinna idiinku wada yar ii keena;
sidaasuu hadalkiinnu ku rumoobi doonaa, mana aad dhiman
doontaan. Iyana sidii bay yeeleen. 21 Markaasay waxay
isku yidhaahdeen, Runtii walaalkeen eed baan ka galnay,
maxaa yeelay, waxaynu aragnay naftiisii dhibaatada ku jirtay,
markuu ina baryay, mana aynu maqlin, sidaas daraaddeed
ayay dhibaatadanu inoogu dhacday. 22 Markaasaa Ruubeen
u jawaabay iyagii, oo wuxuu ku yidhi, Miyaanan idinla hadlin
oo idinku odhan, Wiilka ha ku dembaabina, oo sow ima
aydin maqli waayin? Haddaba bal eega, dhiiggiisii baa laydin
weyddiistaye. 23 Oo iyana ma ay ogayn in Yuusuf gartay
iyaga; waayo, turjumaan baa kala dhex joogay. 24 Markaasuu
ka sii jeestay iyagii, wuuna ooyay; oo haddana intuu ku
soo noqday ayuu la hadlay, oo wuxuu kala dhex baxay
Simecoon, wuuna xidhay isagii iyagoo arkaya. 25 Markaasaa
Yuusuf wuxuu amray in joonyadahoodii hadhuudh looga
buuxiyo, iyo in nin walba lacagtiisii loogu celiyo joonyaddiisii
iyo in sahay jidka loo siiyo, oo sidii baana loo yeelay. 26
Markaasay hadhuudhkoodii dameerradoodii ku rarteen,
wayna ka tageen halkaas. 27 Meeshay ku hoydeen markii
uu midkood joonyaddiisii ugu furay inuu dameerkiisii cunto
siiyo ayuu arkay lacagtiisii oo ku jirta joonyaddiisii afkeeda.
28 Markaasuu walaalihiis ku yidhi, Lacagtaydii waa lay
soo celiyey; oo waxay ku jirtaa joonyaddayda, markaasay
qalbiga ka nexeen, oo ay isku jeesteen iyagoo gariiraya,
oo waxay isku yidhaahdeen, Waa maxay waxakan Ilaah
inagu sameeyey? 29 Markaasay aabbahood Yacquub ugu
yimaadeen dalkii Kancaan, oo waxay isagii u sheegeen
wixii ku dhacay oo dhan, iyagoo leh, 30 Ninka sayidka u
ah dalka ayaa si qallafsan noola hadlay, oo wuxuu noo
qaatay inaannu dalka basaasayno. 31 Oo waxaannu isagii
ku nidhi, Annagu waxaannu nahay niman daacad ah; oo
basaasyo ma aannu nihin. 32 Waxaannu nahay laba iyo
toban walaalo ah, oo ah wiilashii aabbahayo. Mid ma joogo,

kii noogu yaraana maanta dalkii Kancaan ayuu aabbahayo
la joogaa. 33 Markaasaa ninkii sayidka u ahaa dalka wuxuu
nagu yidhi, Inaad niman daacad ah tihiin tanaan idinku
garan doonaaye; walaalihiin mid igaga taga, oo hadhuudh u
qaada reerihiinna abaaraysan, oo iska taga, 34 oo ii keena
walaalkiinnii idiinku wada yaraa, markaasaan garan doonaa
inaydaan basaasyo ahayn, laakiinse inaad tihiin niman
daacad ah. Markaasaan walaalkiin idin siin doonaa, dalkana
waad ka baayacmushtari doontaan. 35 Oo waxay noqotay in
markay joonyadahoodii hadhuudhkii ka shubeen, nin walba
xidhmadiisii lacagta ahayd ay ugu jirtay joonyaddiisii, oo
markii iyaga iyo aabbahood ay arkeen xidhmooyinkoodii
lacagta ahaa ayay baqeen. 36 Markaasaa aabbahood
Yacquub wuxuu iyagii ku yidhi, Gablan baad iga dhigteen, bal
eeg, Yuusuf ma joogo, oo Simecoon ma joogo, oo haddana
waxaad kaxayn doontaan Benyaamiin; waxyaalahan oo
dhammu waa iga gees. 37 Markaasaa Ruubeen aabbihiis
la hadlay, oo wuxuu ku yidhi, Haddii aan isaga kuu keeni
waayo, dil labadayda wiil. Aniga ii dhiib isaga, oo anna waan
kuu soo celin doonaa. 38 Markaasuu yidhi, Wiilkaygu idinla
dhaadhici maayo; waayo, walaalkiis waa dhintay, oo keligiis
baa hadhay. Haddii jidka aad sii maraysaan belaayo kaga
dhacdo isaga, de markaas cirradayda caloolxumaad qabriga
la gelin doontaan. **(Sheol h7585)**

**43** Abaartuna dalka aad bay ugu xumayd. 2 Oo markii
ay wada cuneen hadhuudhkii ay Masar ka keeneen
ayaa aabbahood ku yidhi, Bal taga haddana, oo cunto yar
inoo soo iibiya. 3 Markaasaa Yahuudah la hadlay isagii,
oo wuxuu ku yidhi, Ninkii aad buu noogu digay, oo wuxuu
nagu yidhi, Wejigayga ma aad arki doontaan in walaalkiin
idinla jiro mooyaane. 4 Haddaad walaalkayo na raacisid,
waannu dhaadhacaynaa oo cuntaannu kuu soo iibinaynaa,
5 laakiinse haddaadan isaga dirin, annagu dhaadhici mayno;
waayo, ninkii wuxuu nagu yidhi, Wejigayga ma aad arki
doontaan in walaalkiin idinla jiro mooyaane. 6 Markaasaa
Israa'iil wuxuu yidhi, Maxaad sida xun iigula macaamilooteen,
oo aad ninka ugu sheegteen inaad walaal kale leedihiin? 7
Markaasay yidhaahdeen, Ninku wuu na haybsaday annaga
iyo xigaalkayaga, oo wuxuuna yidhi, Aabbihiin weli ma nool
yahay? Walaal kale ma leedihiin? Oo annana waxaannu ugu
jawaabnay wixii uu na weyddiiyey; waayo, miyaannu sinaba
ku garan karnay inuu nagu odhan doono, Walaalkiin keena?
8 Markaasaa Yahuudah wuxuu ku yidhi aabbihiis Israa'iil,
Wiilka i raaci, oo markaas waannu kici oo waannu tegi
doonnaa, inaynu noolaanno, oo aynaan dhiman, annaga,
iyo adiga, iyo dhallaankayaguba. 9 Anigaa dammiin u
noqon doona oo anaad i weyddiisan doontaa isaga. Haddii
aan kuu keeni waayo isaga oo aan hortaada soo joojin
waayo, aniga eeddu ha i saarnaato weligay, 10 waayo,
haddaannan raagin, hubaal hadda mar labaad waannu soo
noqon lahayn. 11 Markaasaa aabbahood Israa'iil wuxuu
iyagii ku yidhi, Hadday haatan saas tahay, bal tan yeela,
haddaba midhaha ugu fiican oo dalka weelashiinna ku
qaada, oo bal ninkii hadiyad ugu geeya, wuxoogaa beeyo
ah, iyo wuxoogaa malab ah, iyo xawaash iyo malmal, iyo
lows iyo yicib; 12 gacantiinnana lacag labanlaab ah ku
qaada, oo lacagtii joonyadihiinna afkooda lagu soo celiyeyna
haddana gacantiinna ku qaada, waayo, mindhaa waa la
soo qaldamay. 13 Walaalkiinna kaxeeya, oo kaca, oo bal
haddana ninkii u taga, 14 oo Ilaaha Qaadirka ahu naxariis ha
idinka siiyo ninka hortiisa, inuu idiin sii daayo walaalkiinnii
kale iyo Benyaamiin. Oo haddaan carruurtayda ka gablamo,
anaa gablamay. 15 Markaasaa nimankii waxay qaadeen
hadiyaddii, lacag labanlaab ahna gacantooday ku qaadeen,
Benyaamiinna way kaxeeyeen, wayna kaceen oo Masar
tageen, oo waxay hor istaageen Yuusuf. 16 Oo markii Yuusuf
arkay Benyaamiin oo iyaga la jira ayuu wakiilkii gurigiisa
ku yidhi, Nimanka guriga soo geli, dabadeedna neef qal
oo diyaari, waayo, duhurka nimanku anigay ila qadayn
doonaan. 17 Markaasaa ninkii yeelay wixii Yuusuf ku amray;
oo ninkii wuxuu nimankii soo geliyey gurigii Yuusuf. 18
Nimankiina waa cabcabsadeen, maxaa yeelay, waxaa la
soo geliyey gurigii Yuusuf; oo waxay isku yidhaahdeen,
Lacagtii markii hore lagu soo celiyey joonyadaheenna weeye
waxa laynoo soo xeraystay; wuxuu doonayaa inuu wax
inoo qabsado, oo uu ina dhaco, oo uu ina addoonsado,
dameerradeennana qaato. 19 Markaasay waxay u soo
dhowaadeen wakiilkii guriga Yuusuf, oo waxay isagii kula
hadleen albaabkii guriga, 20 waxayna ku yidhaahdeen,
Sayidkayagiiyow, markii hore waxaannu u soo dhaadhacnay
inaannu cunto iibsanno, 21 oo markii aannu meel aannu ku
hoyanno gaadhnay ayaannu furnay joonyadahayagii, oo
bal eeg, nin walba lacagtiisii waxay ugu jirtay joonyaddiisa
afkeeda, waxay ahayd lacagtayadii oo miisaankeedii dhan
yahay; oo haddana gacantayadaannu ku soo celinnay. 22
Oo lacag kale oo aannu cunto ku iibsannona waan la soo
dhaadhacnay. Annagu garan mayno kii lacagtayadii ku
riday joonyadahayagii. 23 Isna wuxuu yidhi, Nabad ha idiin
ahaato, ee ha cabsanina. Ilaahiinna ah Ilaaha aabbihiin
ayaa maal idiinku riday joonyadihiinnii. Anigu waan helay
lacagtiinnii. Markaasuu Simecoon dibadda ugu soo bixiyey
iyagii. 24 Oo ninkii baa nimankii soo geliyey gurigii Yuusuf,
oo biyo siiyey, kolkaasay cagamaydheen. Dameerradoodiina

cuntuu siiyey. **25** Markaasay diyaariyeen hadiyaddii intuusan
Yuusuf duhurkii iman; waayo, waxay maqleen inay halkaas
wax ka cuni doonaan. **26** Oo markii Yuusuf gurigii yimid
ayay gurigii ugu keeneen hadiyaddii gacantooda ku jirtay,
markaasay u wada sujuudeen oo wejiga dhulka saareen. **27**
Isna markaasuu nabdaadiyey iyagii, oo wuxuu ku yidhi, Ninkii
duqa ahaa oo aad sheegteen oo aabbihiin ahaa ma ladan
yahay? Weli miyuu nool yahay? **28** Markaasay yidhaahdeen,
Addoonkaagii aabbahayo ahaa waa ladan yahay, welina
wuu nool yahay. Kolkaasay madaxa fooroOriyeen, oo ay
u sujuudeen. **29** Markaasuu intuu indhihiisii kor u taagay
wuxuu arkay Benyaamiin oo ahaa walaalkiisii hooyo, oo
wuxuu yidhi, Kanu ma walaalkiinnii idiinku yaraa oo aad ii
sheegteen baa? Oo wuxuu ku yidhi, Wiilkaygiiyow, Ilaah ha
kuu roonaado. **30** Markaasuu Yuusuf dhaqsaday, oo goobtay
meel uu ku ooyo, waayo, walaalkiis buu u beernuglaaday
oo wuxuu galay qowladdiisii, oo halkaasuu ku ooyay. **31**
Kolkaasuu intuu fooldhaqday soo baxay; oo intuu adkaystay
ayuu wuxuu yidhi, Cunto noo soo dhiga. **32** Markaasay isagii
gooni ahaantiis ugu dhigeen, iyagiina gooni ahaantood,
Masriyiintii isaga la cuntayna gooni ahaantood; maxaa
yeelay, Masriyiintu lama ay cuni karin Cibraaniyada, waayo,
taasu Masriyiinta karaahiyo bay u ahayd. **33** Oo waxay hor
fadhiisteen isagii, curadka sidii curadnimadiisii ahayd buu
u fadhiistay, kii ugu yaraana yaraannimadiisii; markaasaa
nimankii midba midka kale eegay oo ay wada yaabeen.
**34** Markaasaa hortiisa waxaa iyagii looga qaaday dhawr
qaybood oo cunto ah, laakiinse intii Benyaamiin shan jeer
bay ka weynayd kuwa kale intoodii. Kolkaasay wax cabbeen
oo ay la farxeen isagii.

**44** Markaasuu amray wakiilkii gurigiisa, oo ku yidhi,
Nimanka joonyadahooda cunto uga buuxi, in alla
intay qaadi karaan, nin walba lacagtiisana joonyaddiisa
afkeeda ugu rid. **2** Kan ugu yar joonyaddiisa afkeedana
waxaad ku riddaa koobkayga lacagta ah iyo lacagtiisii uu
hadhuudhka ku doonayay. Markaasuu yeelay hadalkii Yuusuf
kula hadlay. **3** Oo markii waagii beryay ayaa nimankii la
diray, iyagii iyo dameerradoodiiba. **4** Oo markay magaaladii
dibadda uga baxeen, oo ayan weli fogaan, ayaa Yuusuf ku
yidhi wakiilkiisii, Kac oo ka daba tag nimankii, oo markaad
gaadhid, waxaad ku tidhaahdaa, Maxaad wanaag xumaan
noogu abaalguddeen? **5** Miyuusan kanu ahayn koobka
sayidkaygu wax ku cabbo, oo uu ku faaliyo? Wax xun
baad samayseen markaad saas yeesheen. **6** Kolkaasuu
gaadhay, oo uu hadalkan kula hadlay. **7** Markaasay waxay
isagii ku yidhaahdeen, Sayidkaygiiyow, hadalka caynkan
ah maxaad ugu hadlaysaa? Yaanay noqon in annagoo ah
addoommadaada aannu wax caynkaas ah samayno. **8**
Bal eeg, lacagtii aannu ka dhex helnay joonyadahayaga
afafkooda ayaannu kaaga soo celinnay dalkii Kancaan; de
haddaba sidee baannu guriga sayidkaaga uga xadi karnaa
lacag ama dahab? **9** Ku alla kii addoommadaada ka mid
ah oo laga helo, kaasu ha dhinto, annaguna addoommo
baannu kuu noqon doonnaa, sayidkaygiiyow. **10** Markaasuu
yidhi, Waa yahay, oo haatan sidaad tidhaahdeen ha noqoto.
Kii laga helo addoon buu ii noqon doonaa, idinkuna waad
eedla'aan doontaan. **11** Markaasay degdegeen, oo nin waluba
joonyaddiisii buu dhulka dhigay, dabadeedna nin waluba
joonyaddiisii buu furay. **12** Kolkaasuu baadhay, oo wuxuu
ka bilaabay kii ugu weynaa, oo wuxuu ku dhammeeyey
kii ugu yaraa; oo koobkiina waxaa laga helay joonyaddii
Benyaamiin. **13** Kolkaasay dharkoodii jeexjeexeen, oo
nin waluba dameerkiisii buu rartay, oo magaaladii bay ku
noqdeen. **14** Markaasaa Yahuudah iyo walaalihiis waxay
yimaadeen gurigii Yuusuf; oo isna weli halkaasuu joogay.
Kolkaasay hortiisa dhulka isku tuureen. **15** Oo Yuusufna
wuxuu iyagii ku yidhi, Waxan aad samayseen waa maxay?
Miyaydnaan ogayn ninkii anoo kale ahu inuu faalin karo? **16**
Markaasaa Yahuudah ku yidhi, Maxaannu kuugu jawaabnaa,
sayidkaygiiyow? Oo maxaannu ku hadalnaa? Ama sidee
baannu ku eed baxnaa? Ilaah waa soo saaray dembigayagii
annagoo ah addoommadaada; bal eeg, sayidkaygiiyow,
waxaannu nahay addoommadaada, annaga iyo kii gacantiisa
koobka laga helayba. **17** Markaasuu yidhi, Yaanay noqon
inaan saas yeelo. Ninkii gacantiisa koobka laga helay
ayaa addoon ii noqon doona; laakiinse idinku kaca oo
nabdoonaan aabbihiin ugu taga. **18** Markaasaa Yahuudah
u soo dhowaaday oo ku yidhi, Sayidkaygiiyow, anigoo
addoonkaaga ah waxaan kaa baryayaa inaan hadal yar
kugula hadlo, sayidkaygiiyow, oo ha ii cadhoon anigoo ah
addoonkaaga; waayo, waxaad la mid tahay sida Fircoon
oo kale. **19** Sayidkaygiiyow, annagoo ah addoommadaada,
ayaad wax na weyddiisay oo nagu tidhi, Aabbe ama walaal
ma leedihiin? **20** Oo annaguna waxaannu kugu nidhi,
Sayidkaygiiyow, waxaannu leennahay aabbe duq ah, iyo wiil
yar oo uu dhalay markuu gaboobay, oo walaalkiisna waa
dhintay, oo keligiis baa ka hadhay bahdoodii, aabbihiisna
waa jecel yahay isaga. **21** Oo adigu waxaad nagu tidhi,
annagoo ah addoommadaada, Bal ii keena isaga, aan
indhahayga saaree. **22** Oo annaguna waxaannu kugu
nidhi, sayidkaygiiyow, Yarku aabbihiis kama tegi karo;
waayo, hadduu ka tago aabbihiis, de markaas aabbihiis waa
dhiman lahaa. **23** Oo adna waxaad nagu tidhi, annagoo ah

addoommadaada, Haddii uusan walaalkiinnii idiinku yaraa
idin soo raacin, wejigayga mar dambe ma aad arki doontaan.
24 Oo markii aannu u tagnay aabbahay oo addoonkaaga ah,
ayaannu isaga u sheegnay hadalladaadii, sayidkaygiiyow.
25 Oo aabbahayo wuxuu nagu yidhi, Orda haddana oo
wuxoogaa yar oo cunto ah inoo soo iibiya. 26 Oo waxaannu
ku nidhi, Ma tegi karno. Haddiise walaalkayaga noogu yaru
na raaco, markaasaannu dhaadhici doonnaa; waayo, ma
aannu arki karno ninkii wejigiisa, haddii uusan walaalkayaga
noogu yaru nala jirin. 27 Markaasaa addoonkaagii aabbahay
ahaa wuxuu nagu yidhi, Waad og tihiin in naagtaydu
ii dhashay laba wiil; 28 oo uu midkood iga baxay, oo
waxaan idhi, Hubaal cadcad baa loo kala jeexjeexay, tan iyo
waagaasna ma aanan arkin isagii. 29 Oo haddaad kanna
iga kaxaysataan, oo belaayo ku dhacdo isaga, de markaas
cirradayda caloolxumaad qabriga la gelin doontaan. (Sheol
h7585) 30 Haddaba sidaas daraaddeed markii aan u tago
aabbahay oo addoonkaagii ah, haddii uusan wiilku nala
jirin, de naftiisu waxay ku xidhan tahay nafta wiilka, 31 oo
wuu dhiman doonaa markuu arko inuusan yarkii nala jirin;
oo annagoo ah addoommadaada ayaannu aabbahayaga
addoonkaaga ah cirradiisa caloolxumo qabriga la gelin
doonnaa. (Sheol h7585) 32 Waayo, anigoo addoonkaaga ah
ayaa aabbahay dammiin uga noqday wiilka, oo waxaan
ku idhi, Haddaan kuu keeni waayo, xaggaaga eeddu ha
iga saarnaato weligay, Aabbahayow. 33 Haddaba sidaas
daraaddeed, waan ku baryayaaye, aniga oo ah addoonkaagii,
aan wiilka meeshiisii kuu joogo oo aan addoon kuu noqdo,
sayidkaygiiyow; wiilkuna walaalihiis ha iska raaco. 34 Waayo,
sidee baan aabbahay ugu tegi doonaa iyadoo aan yarku ila
jirin? Maba tegi karo waaba intaasoo aan arkaa hoogga
aabbahay ku dhici doona.

**45** Markaasaa Yuusuf ku hor adkaysan kari waayay kuwii
isaga la taagnaa oo dhan; oo wuxuu ku qayliyey,
Nin walba dibadda iiga bixiya. Oo ninnaba lama taagnayn
isaga markii Yuusuf walaalihiis isu sheegay. 2 Markaasuu
intuu codkiisii kor u qaaday ooyay; oo Masriyiintiina way
maqleen, dadkii guriga Fircoonna way maqleen. 3 Markaasuu
Yuusuf wuxuu walaalihiis ku yidhi, Yuusuf baan ahay,
ee aabbahay weli ma nool yahay? Walaalihiisna way u
jawaabi kari waayeen; waayo, aad bay ugu argaggexeen
hortiisa. 4 Markaasaa Yuusuf wuxuu walaalihiis ku yidhi,
Bal ii soo dhowaada, waan idin baryayaaye. Kolkaasay u
soo dhowaadeen. Markaasuu yidhi, Anigu waxaan ahay
walaalkiin Yuusuf, kii aad ka iibiseen kuwii Masar tegayay. 5
Oo haatan ha caloolxumaanina, naftiinnana ha u cadhoonina
iibiskii aad halkan iga iibiseen aawadiis; waayo, Ilaah wuxuu
hortiin ii soo diray in nafo la badbaadiyo. 6 Waayo, labadan
sannadood baa dhulku abaar ahaa, oo weli waxaa hadhay
shan sannadood, oo aan beer la fali doonin, waxna la
goosan doonin. 7 Oo Ilaah wuxuu hortiin ii soo diray inuu
dadkiinna qaar dhulka idiinku reebo, oo uu idiin badbaadiyo
kuwo fara badan oo baxsada. 8 Haddaba sidaas daraaddeed
idinka ma ahayn kii halkan ii soo diray, laakiinse wuxuu ahaa
Ilaah; oo isagu Fircoon buu aabbe iiga dhigay, iyo sayidkii
dadka gurigiisa oo dhan, iyo taliyihii dalka Masar oo dhan.
9 Dhaqsada, oo aabbahay u kaca, oo waxaad isaga ku
tidhaahdaan, Wiilkaagii Yuusuf wuxuu kugu soo yidhi, Ilaah
wuxuu iga dhigay sayidkii Masar oo dhan, ee soo dhaadhac
oo ii kaalay, hana raagin; 10 oo waxaad degi doontaa dhulka
la yidhaahdo Goshen, oo waad ii soo dhowaan doontaa,
adiga iyo carruurtaada, iyo carruurtaada carruurtooda, iyo
adhigaaga iyo lo'daada, iyo waxa aad haysatid oo dhanba;
11 oo halkaasaan kugu quudin doonaa; waayo, weli waxaa
hadhay shan sannadood oo abaar ah, waaba intaasoo aad
gaajootaan, adiga iyo reerkaaga, iyo waxa aad haysatid oo
dhammuba. 12 Oo bal eega, indhihiinnu waa arkaan, iyo
indhaha walaalkay Benyaamiinba, inuu afkaygii yahay kan
idinla hadlaya. 13 Idinku waxaad aabbahay u sheegtaan
ammaantayda aan Masar ku leeyahay oo dhan, iyo wixii aad
aragteen oo dhan; oo dhaqsada oo aabbahay halkan keena.
14 Markaasuu walaalkiis Benyaamiin qoortiisa dhab yidhi,
wuuna ku dul ooyay, Benyaamiinna qoortiisuu ku ooyay. 15
Markaasuu wada dhunkaday walaalihiis oo dhan, wuuna ku
dul ooyay; dabadeedna walaalihiis baa la hadlay isagii. 16
Markaasaa warkii laga maqlay gurigii Fircoon, oo waxaa la
yidhi, Yuusuf walaalihiis baa yimid. Taasna aad bay uga
farxisay Fircoon iyo addoommadiisiiba. 17 Markaasaa Fircoon
wuxuu Yuusuf ku yidhi, Walaalahaa waxaad ku tidhaahdaa,
Idinku sidan yeela, gaadiidkiinna rarta, oo taga oo dalkii
Kancaan u kaca; 18 oo waxaad soo kaxaysataan aabbihiin
iyo reerihiinna oo dhan, oo aniga ii kaalaya; oo anna waxaan
idin siin doonaa waxyaalaha wanwanaagsan ee dalka Masar,
oo idinku waxaad cuni doontaan barwaaqada dalka. 19
Haddaba waa lagu amray, Sidan yeela. Gaadhifardood dalka
Masar uga kaxaysta dhallaankiinna, iyo dumarkiinna; oo
aabbihiin keena, oo kaalaya. 20 Oo alaabtiinnana ha ka
fikirina, waayo, waxyaalaha wanwanaagsan ee dalka Masar
oo dhan idinkaa iska leh. 21 Markaasaa wiilashii Israa'iil
saas yeeleen, Yuusufna wuxuu iyagii siiyey gaadhifardood,
sidii Fircoon amarkiisu ahaa, sahayna jidkuu u siiyey. 22
Dhammaantoodna wuxuu nin kasta siiyey dhar iskujoog
ah; laakiinse Benyaamiin wuxuu siiyey saddex boqol oo

xabbadood oo lacag ah, iyo shan iskujoog. 23 Oo aabbihiisna
sidan buu wax ugu diray, toban dameer oo ay ku raran
yihiin waxyaalihii wanwanaagsanaa ee Masar, iyo toban
dameerood oo hadhuudh iyo cunto ku raran yihiin, iyo
sahaydii aabbihiis jidka ku soo mari lahaa. 24 Markaasuu
walaalihiis diray, oo iyana way tageen; oo wuxuu iyagii ku
yidhi, Idinku jidka ha isugu cadhoonina. 25 Markaasay Masar
ka baxeen, oo ay yimaadeen dalkii Kancaan, oo waxay u
yimaadeen aabbahood Yacquub. 26 Markaasay u sheegeen
oo ku yidhaahdeen, Yuusuf weli waa nool yahay, oo wuxuu
u taliyaa dalka Masar oo dhan. Markaasuu taag darnaaday,
waayo, wuu rumaysan waayay iyagii. 27 Markaasay u
sheegeen hadalkii Yuusuf kula hadlay oo dhan, oo markuu
arkay gaadhifardoodkii Yuusuf u soo diray in isaga lagu
qaado ayaa aabbahood Yacquub ruuxiisii cusboonaaday. 28
Markaasaa Israa'iil wuxuu yidhi, Igu filan mar haddii wiilkaygii
Yuusuf weli nool yahay; haddaba waan tegi doonaa, oo
waan arki doonaa isaga intaanan dhiman.

**46** Markaasaa Israa'iil la guuray wixii uu haystay oo dhan,
oo wuxuu yimid Bi'ir Shebac, oo halkaasuu Ilaaha
aabbihiis Isxaaq allabaryo ugu bixiyey. 2 Markaasaa Ilaah
riyooyinka habeenka kula hadlay Israa'iil oo wuxuu ku
yidhi, Yacquubow, Yacquubow. Isna wuxuu yidhi, Waa i
kan. 3 Markaasuu ku yidhi, Anigu waxaan ahay Ilaaha ah
Ilaaha aabbahaa. Ha ka baqin inaad Masar ku dhaadhacdo,
waayo, anigu halkaas baan kaaga dhigi doonaa quruun
weyn. 4 Anigu Masar baan kuu raaci doonaa, oo hubaal
haddana waan kaa soo bixin doonaa; Yuusufna gacantiisuu
saari doonaa indhahaaga. 5 Markaasaa Yacquub ka
tegey Bi'ir Shebac, wiilashii Israa'iilna waxay aabbahood
Yacquub, iyo dhallaankoodii, iyo dumarkoodiiba ku qaadeen
gaadhifardoodkii Fircoon u soo diray in isaga lagu soo
qaado. 6 Oo waxay kaxaysteen xoolahoodii, iyo alaabtoodii
ay ka heleen dalkii Kancaan, oo waxayna yimaadeen
Masar, Yacquub iyo farcankiisii la socday oo dhammuba;
7 kuwaas oo ahaa wiilashiisii iyo wiilashiisii wiilashoodii
isaga la socday, iyo gabdhihiisii iyo wiilashiisii gabdhahoodii.
Farcankiisii oo dhanna wuxuu keenay Masar. 8 Kuwanu
waa magacyadii reer binu Israa'iil oo Masar yimid, Yacquub
iyo wiilashiisii: Ruubeen wuxuu ahaa curadkii Yacquub. 9
Wiilashii Ruubeenna waxay ahaayeen Xanoog, iyo Falluu,
iyo Xesroon, iyo Karmii. 10 Wiilashii Simecoonna waxay
ahaayeen Yemuu'eel, iyo Yaamiin, iyo Ohad, iyo Yaakiin, iyo
Sohar, iyo Shaa'uul oo ay naag reer Kancaan ihi dhashay. 11
Wiilashii Laawina waxay ahaayeen Gershoon, iyo Qohaad,
iyo Meraarii. 12 Wiilashii Yahuudahna waxay ahaayeen Ceer,
iyo Oonaan, iyo Sheelaah, iyo Feres, iyo Serax; laakiinse
Ceer iyo Oonaan waxay ku dhinteen dalkii Kancaan. Wiilashii
Feresna waxay ahaayeen Xesroon iyo Xaamuul. 13 Wiilashii
Isaakaarna waxay ahaayeen Toolac iyo Fuwaah, iyo Yoob,
iyo Shimroon. 14 Wiilashii Sebulunna waxay ahaayeen
Sered, iyo Eeloon, iyo Yaxle'eel. 15 Intaasu waa wiilashii
Lee'ah oo ay Yacquub ugu dhashay Fadan Araam, iyo weliba
gabadhiisii Diinah ahayd. Yacquub wiilashiisa iyo gabdhihiisa
oo dhammu waxay ahaayeen saddex iyo soddon. 16 Wiilashii
Gaadna waxay ahaayeen Sifiyoon, iyo Xaggii, iyo Shuunii,
iyo Esboon, iyo Ceerii, iyo Aroodii, iyo Areelii. 17 Wiilashii
Aasheerna waxay ahaayeen Yimnaah, iyo Yishwaah, iyo
Yishwii, iyo Beriicaah, iyo walaashood Serax; wiilashii
Beriicaahna waxay ahaayeen Xeber iyo Malkii'eel. 18 Kuwanu
waa wiilashii Silfah, tii uu Laabaan siiyey gabadhiisii Lee'ah,
oo intaasay Yacquub u dhashay, waxayna ahaayeen lix iyo
toban. 19 Naagtii Yacquub oo Raaxeel ahayd wiilasheedii
waxay ahaayeen Yuusuf iyo Benyaamiin. 20 Yuusufna dalka
Masar waxaa ugu dhashay Manaseh iyo Efrayim, oo waxaa
u dhashay Aasenad ina Footiiferac, oo wadaadkii Oon ahaa.
21 Wiilashii Benyaamiinna waxay ahaayeen Belac, iyo Beker,
iyo Ashbeel, iyo Geeraa, iyo Nacamaan, iyo Eexii, iyo Rosh,
iyo Mufiim, iyo Xufiim, iyo Ared. 22 Kuwanu waa wiilashii
Raaxeel u dhashay Yacquub, kulligoodna waxay ahaayeen
afar iyo toban. 23 Wiilashii Daanna waxay ahaayeen Xushiim.
24 Wiilashii Naftaalina waxay ahaayeen Yaxse'eel, iyo Guunii,
iyo Yeser, iyo Shilleem. 25 Kuwanuna waa wiilashii Bilhah, tii
uu Laabaan siiyey gabadhiisii Raaxeel, oo intaasay Yacquub
u dhashay; kulligoodna waxay ahaayeen toddoba. 26 Intii
Yacquub Masar la timid, oo xanjaadkiisa ka soo baxday,
haddaan lagu darin wiilashii Yacquub naagahooda, kulligood
waxay ahaayeen lix iyo lixdan. 27 Wiilashii Yuusuf Masar ugu
dhashayna waxay ahaayeen laba. Reerkii Yacquub dadkiisii
Masar yimid oo dhammu waxay ahaayeen toddobaatan. 28
Markaasuu wuxuu iska hor mariyey Yahuudah inuu Yuusuf
u tago, si uu u tuso jidka loo maro Goshen; oo waxay
yimaadeen dalkii Goshen. 29 Yuusufna wuxuu diyaarsaday
gaadhifaraskiisii, oo aabbihiis Israa'iil ayuu kaga hor tegey
Goshen; oo markuu isagii arkay ayuu qoortiisii dhab yidhi,
qoortiisana wuxuu ku dul ooyay wakhti dheer. 30 Israa'iilna
wuxuu Yuusuf ku yidhi, Haddaba aan iska dhinto, mar
haddaan arkay wejigaaga, oo aad weli nooshahay. 31
Yuusufna wuxuu walaalihiis iyo reerkii aabbihiis ku yidhi,
Waan tegi, oo Fircoon baan u sheegi, oo waxaan ku odhan,
Walaalahay iyo reerkii aabbahay oo joogi jiray dalka Kancaan
ayaa ii yimid. 32 Nimankaasuna waa adhijirro, waayo, waxay
ahaan jireen lo'ley; waxayna la yimaadeen adhigoodii, iyo

lo'doodii, iyo waxay haysteen oo dhan. **33** Markii Fircoon
idiin yeedho, oo idinku yidhaahdo, Shuqulkiinnu waa maxay?
**34** waxaad ku tidhaahdaan, Annagoo addoommadaada ah
waxaannu tan iyo yaraantayadii ahaan jirnay lo'ley, annaga
iyo awowayaashayoba; si aad u degtaan dalka Goshen;
waayo, adhijir waluba waa u karaahiyo Masriyiinta.

**47** Markaasaa Yuusuf gudaha galay oo uu Fircoon u
warramay, wuxuuna ku yidhi, Aabbahay iyo walaalahay,
iyo adhigoodii, iyo lo'doodii, iyo waxay haystaan oo dhammu
way ka yimaadeen dalkii Kancaan, oo bal eeg, haatan
waxay joogaan dalka Goshen. **2** Oo walaalihiisna wuxuu
ka kaxeeyey shan nin, oo wuxuu hor taagay Fircoon. **3**
Markaasaa Fircoon wuxuu Yuusuf walaalihiis ku yidhi,
Shuqulkiinnu waa maxay? Markaasay waxay Fircoon ku
yidhaahdeen, Annagoo addoommadaada ah waxaannu
nahay adhijirro, annaga iyo awowayaashayoba. **4** Oo waxay
Fircoon ku yidhaahdeen, Inaannu qariib ahaan dhulka u
joogno ayaannu u nimid, waayo, adhiga addoommadaadu
daaq ma haysto, maxaa yeelay, abaartu aad bay ugu xun
tahay dalkii Kancaan; haddaba waxaannu kaa baryaynaa
inaannu annagoo addoommadaada ah degno dalka Goshen.
**5** Markaasaa Fircoon la hadlay Yuusuf, oo wuxuu ku yidhi,
Aabbahaa iyo walaalahaa aday kuu yimaadeen. **6** Dalka
Masarna wuu ku hor yaal; haddaba dalka meesha ugu
wanaagsan aabbahaa iyo walaalahaa deji, oo dalka Goshen
ha degeen. Oo haddaad ku garanaysid rag karti leh, de
ka dhig kuwo xoolahayga u taliya. **7** Markaasaa Yuusuf
aabbihiis Yacquub gudaha soo geliyey, oo wuxuu soo hor
taagay Fircoon; Yacquubna Fircoon wuu u duceeyey. **8**
Fircoonna wuxuu Yacquub ku yidhi, Immisa jir baad tahay?
**9** Markaasaa Yacquub wuxuu Fircoon ku yidhi, Sannadihii
aan qariibka ahaa waa boqol iyo soddon; cimrigaygu waa
yaraa, wuuna xumaa, mana gaadhin cimrigii awowayaashay
qariibka ahaayeen. **10** Yacquubna Fircoon wuu u duceeyey,
markaasuu Fircoon hortiisa ka tegey. **11** Markaasuu Yuusuf
aabbihiis iyo walaalihiis dejiyey dalkii Masar oo uu ka siiyey
meel hanti ah, taasoo ah meeshii dalka ugu wanaagsanayd
oo ku tiil dalka la yidhaahdo Racmeses, sidii Fircoon ku
amray. **12** Yuusufna aabbihiis iyo walaalihiis, iyo reerkii
aabbihiis oo dhan, sidii ay carruurtoodii tiradoodii ahayd,
ayuu u quudiyey. **13** Dalkii oo dhanna cunto ma jirin;
waayo, abaartu aad bay u xumayd, sidaas daraaddeed dalkii
Masar iyo dalkii Kancaan abaartay la taag darnaadeen. **14**
Yuusufna wuxuu ururiyey lacagtii dalka Masar tiil oo dhan,
iyo tii dalka Kancaan tiil oo dhan, waayo, hadhuudh bay
kaga iibsadeen; Yuusufna lacagtii wuxuu keenay gurigii
Fircoon. **15** Oo markii lacagtii ka wada dhammaatay dalkii
Masar iyo dalkii Kancaanba ayay Masriyiintii oo dhammu u
yimaadeen Yuusuf, oo waxay ku yidhaahdeen, Cunto na
sii, waayo, maxaannu hortaada ugu dhimanaynaa? Maxaa
yeelay, lacagtayadii way naga dhammaatay. **16** Markaasaa
Yuusuf wuxuu ku yidhi, Haddii lacagtii idinka dhammaatay,
xoolihiinna keena, oo anna xoolihiinna ayaan cunto idinka
siin doonaa. **17** Markaasay xoolahoodii Yuusuf u keeneen,
Yuusufna wuxuu iyagii cunto ugu beddelay fardihii, iyo
adhigii, iyo lo'dii iyo dameerradii; oo sannaddaas ayuu
quudiyey oo xoolahoodii oo dhan cunto ugu beddelay. **18** Oo
markii sannaddaasi dhammaatay ayay sannaddii labaad
u yimaadeen, oo waxay ku yidhaahdeen, Sayidkaygiiyow,
kaa qarin mayno in lacagtayadii oo dhammu naga idlaatay,
ishkinkii lo'da ahaana adigaa leh, sayidkaygiiyow, waxba
kuma hadhin hortaada, sayidkaygiiyow, jidhkayaga iyo
dhulalkayaga mooyaane. **19** De haddaba maxaannu hortaada
ugu dhimanaynaa annaga iyo dhulkayaguba? Annaga iyo
dhulkayagaba cunto nagu iibso, oo annaga iyo dhulkayaguba
Fircoon baannu addoommo u noqon doonnaa. Abuur la beero
na sii inaannu noolaanno, oo aannan dhiman, dhulkayaguna
uusan baabbi'in. **20** Yuusufna dhulkii Masar oo dhan Fircoon
buu u iibiyey, waayo, Masriyiintii nin waluba wuxuu iibiyey
beertiisii, maxaa yeelay, abaartaa ku xumayd iyaga; dhulkiina
waxaa yeeshay Fircoon. **21** Dadkiina wuxuu u wareejiyey
magaalooyinka dhulka Masar darafkiisa ilaa darafka kale.
**22** Wuxuusan iibsan dhulkii wadaaddada oo keliya, waayo,
wadaaddadu qayb bay ku lahaan jireen Fircoon, oo waxay
cuni jireen qaybtii Fircoon siin jiray, oo sidaas daraaddeed
ma ay iibsan dhulkoodii. **23** Markaasaa Yuusuf wuxuu dadkii
ku yidhi, Bal eega, maantaan Fircoon idiin iibiyey idinka
iyo dhulkiinnaba; haddaba abuurkan qaata oo dhulka ku
beera. **24** Markii aad wax soo goosataan, waxaad Fircoon
siisaan shan meelood meel, afarta kalena waxay idiin ahaan
doonaan abuur aad beerta ku abuurtaan iyo cuntadiinna
iyo cuntadii reerihiinna iyo cuntadii dhallaankiinnaba. **25**
Markaasay iyana waxay yidhaahdeen, Adigu noloshayada
waad badbaadisay, haddaba, sayidkayagiiyow, naga raalli
ahow, oo annana waxaannu Fircoon u noqon doonnaa
addoommo. **26** Yuusufna wuxuu sameeyey qaynuun ku
saabsan dhulka Masar in ilaa maantadan la joogo Fircoon
lahaado shantii meeloodba meel, Fircoonna wuxuusan
yeelan dhulkii wadaaddada oo keliya. **27** Reer binu Israa'iilna
waxay degeen dalka Masar, xagga dhulka Goshen; oo
halkaas bay maal ka heleen, wayna bateen, oo aad iyo aad
bay u tarmeen. **28** Yacquubna wuxuu dalka Masar ku noolaa
toddoba iyo toban sannadood, oo Yacquub cimrigiisu wuxuu

ahaa boqol iyo toddoba iyo afartan sannadood. 29 Wakhtigii
Israa'iil dhiman lahaana waa soo dhowaaday, markaasuu
wiilkiisii Yuusuf u yeedhay, oo wuxuu ku yidhi, Haddaba
haddii aad raalli iga tahay, waan ku baryayaaye, gacantaada
bowdadayda hoos geli, oo si raxmad leh oo daacad ah igu
la dhaqan. Haddaba waan ku baryayaaye, Masar ha igu
aasin, 30 laakiinse meydkaygu ha la jiifo awowayaashay;
waa inaad Masar iga qaaddaa oo aad igu aastaa meeshii
lagu aasay awowayaashay. Markaasuu isna yidhi, Waan
yeeli doonaa sidaad igu tidhi. 31 Markaasuu ku yidhi, Ii
dhaaro, isna wuu u dhaartay. Markaasaa Israa'iil sariirta
madaxeedii ku foororsaday.

**48** Waxyaalahaas ka dib waxaa Yuusuf lagu yidhi, Bal eeg,
aabbahaa waa bukaaye. Markaasuu wuxuu kaxaystay
labadiisii wiil oo ahaa Manaseh iyo Efrayim. 2 Kolkaasaa
waxaa Yacquub loo soo sheegay, oo lagu yidhi, Bal eeg,
wiilkaagii Yuusuf baa kuu imanaya. Markaasaa Israa'iil
intuu xoog isgeliyey ayuu soo dul fadhiistay sariirtiisii. 3
Markaasaa Yacquub wuxuu Yuusuf ku yidhi, Ilaaha Qaadirka
ah ayaa iigu muuqday Luus oo ku taal dalka Kancaan,
wuuna i barakeeyey, 4 oo wuxuu igu yidhi, Bal eeg waan
ku badin doonaa, waanan ku tarmin doonaa, oo waxaan
kaa dhigi doonaa dad fara badan; dhulkanna waxaan siin
doonaa farcankaaga kaa dambeeya, inuu hanti aan weligeed
dhammaanayn u ahaado. 5 Haddaba labadaadii wiil oo dalka
Masar kuugu dhashay, intaanan kuugu iman Masar, anigaa
iska leh. Efrayim iyo Manaseh ayaan u lahaan doonaa
sida Ruubeen iyo Simecoon. 6 Carruurta aad iyaga ka dib
dhasho, adigaa iska lahaan doona, waana in loo bixiyo
magacyada walaalahood markay wax dhaxlaan. 7 Anigana,
markii aan ka imid Fadan ayaa Raaxeel igaga dhimatay
dalkii Kancaan waddada loo maro, intaanan weli Efrad soo
gaadhin; oo kolkaasaan iyadii ku aasay waddada loo maro
Efrad, meeshaasuna waa Beytlaxam. 8 Markaasaa Israa'iil
intuu wiilashii Yuusuf dhugtay ayuu yidhi, Kuwanu waa
ayo? 9 Markaasaa Yuusuf wuxuu aabbihiis ku yidhi, Waa
wiilashaydii Ilaah halkan igu siiyey. Markaasuu isna wuxuu ku
yidhi, Waan ku baryayaaye, iyaga ii soo dhowee, waanan u
ducaynayaa. 10 Haddaba Israa'iil cimrigiisii dheeraa aawadiis
ayuu la indha darnaaday, sidaas daraaddeed waxba ma uu
arki karin. Kolkaasuu iyagii u soo dhoweeyey, wuuna isku
duubay oo dhunkaday. 11 Markaasaa Israa'iil wuxuu Yuusuf
ku yidhi, Uma aan malaynayn inaan wejigaaga arki doono,
oo bal eeg, Ilaah weliba wuxuu i tusay xataa farcankaagii.
12 Markaasaa Yuusuf wuxuu iyagii ka durkiyey lowyihiisii; oo
intuu sujuuday ayuu wejigiisii dhulka saaray. 13 Markaasuu
Yuusuf labadoodiiba kaxeeyey, intuu Efrayim gacantiisii
midigta ahayd ku qabtay oo ku toosan Israa'iil bidixdiisa,
Manasehna ku qabtay bidixdiisii oo ku toosan midigtii Israa'iil,
wuuna u soo dhoweeyey iyagii. 14 Markaasaa Israa'iil soo
fidiyey gacantiisii midigta ahayd, oo wuxuu saaray madaxii
Efrayim oo kii yaraa ahaa. Gacantiisii bidixda ahaydna wuxuu
saaray Manaseh madaxiisii, wuuna isdhaafiyey gacmihiisii,
maxaa yeelay, Manaseh wuxuu ahaa curadkii. 15 Markaasuu
Yuusuf u duceeyey, oo wuxuu yidhi, Ilaaha aabbahay Isxaaq
iyo awowgay Ibraahim ay ku hor socdeen, oo ah Ilaaha i
quudinayay intii aan noolaa oo dhan ilaa maanta, 16 iyo
malaa'igtii iga soo samatabbixisay xumaato oo dhan, wiilasha
ha barakeeyeen; oo magacayga ha lagu magacaabo iyaga,
iyo magicii aabbahay Isxaaq, iyo kii awowgay Ibraahim;
oo dad faro badan dhulka ha ku noqdeen. 17 Oo markii
Yuusuf arkay in aabbihiis gacantiisii midigta ahayd Efrayim
madaxiisa saaray ayuu taas ka xumaaday; markaasuu
gacantii aabbihiis qabtay inuu ka qaado Efrayim madaxiisa
oo uu saaro Manaseh madaxiisa. 18 Oo Yuusufna wuxuu
aabbihiis ku yidhi, Aabbahayow, saas ma aha, waayo,
kanu waa curadkii ee gacantaada midigta ah madaxiisa
saar. 19 Markaasaa aabbihiis diiday oo wuxuu ku yidhi,
Waan ogahay, waan ogahay, wiilkaygiiyow. Isaguna wuxuu
noqon doonaa quruun, wuuna weynaan doonaa; habase
yeeshee walaalkiisa ka yar baa ka weynaan doona, oo
farcankiisu wuxuu noqon doonaa quruumo faro badan. 20 Oo
maalintaasuu u duceeyey iyagii, oo wuxuu yidhi, Reer binu
Israa'iil idinkay idinku ducaysan doonaan, iyagoo leh, Ilaah
ha kaa dhigo sidii Efrayim iyo sidii Manaseh. Oo Efrayimna
wuxuu ka hor mariyey Manaseh. 21 Oo Israa'iilna wuxuu
Yuusuf ku yidhi, Anigu waan dhimanayaa, laakiinse Ilaah baa
kula jiri doona, oo mar labaadna wuxuu ku geeyn doonaa
dhulkii awowayaashaa. 22 Oo weliba waxaan ku siiyey qayb
dheeraad ah, oo aad walaalahaa dheer tahay, waana tii aan
reer Amor kaga qaatay seeftayda iyo qaansadayda.

**49** Markaasuu Yacquub wiilashiisii u yeedhay; oo wuxuu
ku yidhi, Isa soo urursada, aan idiin sheego waxyaalaha
maalmaha ugu dambeeya idinku dhici doona. 2 Wiilashii
Yacquubow, isa soo urursada, oo maqla, Oo i dhegaysta
anigoo ah aabbihiin Israa'iil. 3 Ruubeenow, waxaad tahay
curadkayga, iyo xooggayga, iyo itaalkayga bilowgiisa, Xagga
sharafka adaa u sarreeya, xagga xooggana adaa u sarreeya.
4 Waxaad tahay sida biyo socda, oo ma sarrayn doontid,
Maxaa yeelay, adigu waxaad fuushay sariirtii aabbahaa;
Waanad nijaasaysay. Wuxuu fuulay sariirtaydii. 5 Simecoon
iyo Laawi waa walaalo, Seefahoodu waa hub dirireed. 6

Naftaydiiyey, ha gelin guddigooda, Oo ururkoodana ha la
midoobin, ammaantaydiiyey; Waayo, cadhadoodii nin bay ku
dileen, Oo qushigooday dibi ku boqno jareen. 7 Habaar ha
ku dhaco cadhadooda, waayo, xoog bay lahayd, Habaar
ha ku dhaco ciilkooda, waayo, naxariis ma uu lahayn.
Reer Yacquub baan ku kala qaybin, oo reer binu Israa'iil
baan ku kala firdhin. 8 Yahuudahow, walaalahaa waa ku
ammaani doonaan. Gacantaadu waxay saarnaan doontaa
cadaawayaashaada qoortooda, Anigoo ah aabbahaana
wiilashaydu way kuu sujuudi doonaan, 9 Yahuudah waa
libaax dhashiis. Wiilkaygiiyow, wixii aad ugaadhsatay waad
ka tagtay. Wuu kadaloobsaday, oo wuxuu u jiifsaday sida
aar, Iyo sida gool, haddaba yaa kicin doona? 10 Usha
boqortooyadu kama tegi doonto Yahuudah, Usha taliyuhuna
cagihiisa kama dhex bixi doonto; Ilaa Shiiloh yimaado;
Dadkuna isagay addeeci doonaan. 11 Qaylkiisa wuxuu ku
xidhaa geed canab ah, Dameerkiisa yarna canabka la doorto,
Dharkiisa wuxuu ku maydhaa khamri, Lebiskiisana dhiig
canab. 12 Indhihiisu waxay la guduudan doonaan khamri,
Ilkihiisuna waxay la caddaan doonaan caano. 13 Sebulun
wuxuu degganaan doonaa badda xeebteeda. Wuxuuna
noqon doonaa marsada doonniyaha, Xuduudkiisuna wuxuu
ahaan doonaa Siidoon agteeda. 14 Isaakaar waa dameer
xoog weyn, Oo jiifsada xeryaha idaha dhexdooda. 15
Oo wuxuu arkay meel lagu nasto inay wanaagsan tahay,
Iyo dhulku inuu nimcaysan yahay; Kolkaasuu garbihiisa u
soo goday inuu wax ku qaado, Oo addoon buu u noqday
hawshii. 16 Daanna wuxuu dadkiisa u xukumi doonaa
Sidii qabiilooyinka Israa'iil middood. 17 Daan wuxuu noqon
doonaa abeeso jidka dhex joogta, Iyo jilbis waddada dhex
yaal, Oo fardaha cedhbaha ka qaniina, Si uu kii faraska ku
joogaana dib ugu dhaco. 18 Rabbiyow, waxaan sugayay
badbaadintaada. 19 Waxaa Gaad cidhiidhi gelin doonta guuto
wax dhacda; Laakiinse isna cedhibtooduu cidhiidhi gelin
doonaa. 20 Aasheerna cuntadiisu subag bay lahaan doontaa,
Wuxuuna keeni doonaa cunto ay reer boqor ku farxaan.
21 Naftaali waa cawl la furay, Hadallo wanwanaagsanna
wuu ku hadlaa. 22 Yuusuf waa laan midho leh, Waa laan
midho leh oo il biyo ah ku ag taal; Laamihiisuna derbigay
kor u dhaafaan. 23 Qaansolayaasha ayaa aad u dhibay,
Wayna toogteen oo silciyeen; 24 Laakiinse qaansadiisu xoog
bay sii yeelatay, Dhudhummadii gacmihiisana waxaa lagu
xoogeeyey Gacmaha Kan xoogga leh oo Yacquub, (Kaasuu
adhijirku ka imanayaa, waana dhagaxii Israa'iil) 25 Oo ah
Ilaaha aabbahaa oo ku caawimi doona, Iyo Ilaaha Qaadirka
ah, oo kugu barakayn doona Barakooyinka samada sare, Iyo
barakooyinka moolka hoos jiifa, Iyo barakooyinka naasaha
iyo maxalka. 26 Barakooyinkii aabbahaa Way ka xoog
badnaadeen barakooyinkii awowayaashay Ilaa meesha ugu
fog oo buuraha weligood waara; Waxay saarnaan doonaan
madaxa Yuusuf, Iyo dhakada kan walaalihiis laga soocay. 27
Benyaamiin waa yeey hilib dillaacsada; Oo aroorta wuxuu
cuni doonaa wixii uu ugaadhsaday, Fiidkana wuxuu qaybin
doonaa wixii uu dhacay. 28 Kuwan oo dhammu waa laba
iyo tobankii qabiil oo reer binu Israa'iil; tanuna waa wixii
aabbahood kula hadlay oo ugu duceeyey; mid walbana
sidii ducadiisu ahayd buu ugu duceeyey. 29 Oo wuxuu kula
dardaarmay, oo ku yidhi iyagii, Waxaan ku darman doonaa
dadkaygii. Awowayaashay igula aasa godka ku yaal berrinka
Cefroon kii reer Xeed, 30 kaasoo ah godka ku yaal berrinkii
Makfelah, oo ku hor yaal Mamre, oo dalka Kancaan ku taal,
oo uu Ibraahim Cefroon kii reer Xeed ka iibsaday, godka
iyo berrinkaba, inuu ka dhigto meel xabaaleed oo hanti ah.
31 Halkaasaa lagu aasay Ibraahim iyo afadiisii Saarahba,
halkaasaa lagu aasay Isxaaq iyo afadiisii Rebeqahba, oo
anna Lee'ah baan ku aasay halkaas 32 oo ah berrinka iyo
godka ku dhex yaalba, oo laga iibsaday reer Xeed. 33 Oo
markii Yacquub dhammeeyey dardaarankii uu wiilashiisii
kula dardaarmayay ayuu cagihiisii ku soo urursaday sariirta,
oo markaasuu naf baxay, oo wuxuu ku darmaday dadkiisii.

**50** Markaasaa Yuusuf ku dhacay wejigii aabbihiis, wuuna
ooyay oo dhunkaday. 2 Kolkaasaa Yuusuf wuxuu
addoommadiisii dhakhtarrada ahaa ku amray inay aabbihiis
meydkiisa dawo mariyaan, markaasay dhakhtarradii Israa'iil
dawo mariyeen. 3 Oo waxaa u dhammaaday afartan
maalmood, waayo, sidaasay maalmaha dawomarintu ugu
dhammaan jireen. Masriyiintiina waxay isaga u ooyayeen
toddobaatan maalmood. 4 Oo markii maalmihii loo ooyayay
isaga ay dhammaadeen ayaa Yuusuf la hadlay reerkii
Fircoon oo wuxuu ku yidhi, Waan idin baryayaaye haddaad
haatan raalli iga tihiin, Fircoon iila hadla oo waxaad ku
tidhaahdaan, 5 Aabbahay baa i dhaariyey, oo wuxuu igu
yidhi, Bal eeg, waan dhimanayaa ee waxaad igu aastaa
qabrigaygii aan ka qotay dalka Kancaan. Haddaba waan
ku baryayaaye, ii fasax inaan tago oo aan aabbahay soo
aaso, oo haddana waan soo noqon doonaa. 6 Markaasaa
Fircoon ku yidhi, Tag oo aabbahaa u soo aas siduu kugu
dhaariyey. 7 Markaasaa Yuusuf tegey inuu aabbihiis soo
aaso; oo waxaana isagii raacay addoommadii Fircoon oo
dhan, iyo odayaashii reerkiisa, iyo odayaashii dalka Masar
oo dhan, 8 iyo reerkii Yuusuf oo dhan, iyo walaalihiis,
iyo reerkii aabbihiis. Waxaa keliyahoo ay dalkii Goshen
kaga tageen dhallaankoodii, iyo adhigoodii, iyo lo'doodii. 9
Waxaana isagii raacay gaadhifardoodyo, iyo fardooley; oo

waxay ahaayeen guuto aad u weyn. 10 Markaasay waxay
yimaadeen goobtii hadhuudhka lagu tumi jiray oo Aataad,
oo Webi Urdun ka shishaysay, oo halkaasay ku baroorteen
baroor aad u weyn oo daran; oo aabbihiis buu toddoba
maalmood oo loo baroortay u dhigay. 11 Oo markii dadkii
reer Kancaan oo dalka degganaa ay arkeen baroortii ka
dhacday goobtii Aataad ayay waxay yidhaahdeen, Tanu
waa baroor ku xun Masriyiinta. Oo sidaas daraaddeed
waxaa magaceedii loo bixiyey Aabeel Masriyiin, oo waxay
ka shishaysaa Webi Urdun. 12 Wiilashiisiina way u yeeleen
wixii uu kula dardaarmay iyaga, 13 maxaa yeelay, wiilashiisii
waxay isagii u qaadeen dalkii Kancaan, oo waxay ku aaseen
godkii ku dhex yiil berrinkii Makfelah, oo Ibraahim u iibsaday
isaga iyo berrinkaba inuu ka dhigto meel xabaaleed oo hanti
ah, wuxuuna ka iibsaday Cefroon kii reer Xeed, oo wuxuu ku
hor yaal Mamre. 14 Yuusufna markuu aabbihiis aasay ka dib,
wuxuu ku noqday Masar, isagii iyo walaalihiis, iyo kulli intii
isaga u raacday oo dhan inay aabbihiis la soo aasaan. 15
Oo markay Yuusuf walaalihiis arkeen in aabbahood dhintay
ayay isku yidhaahdeen, Mindhaa Yuusuf waa ina nebcaan
doonaa oo wuu inaga magan doonaa xumaantii aynu ku
samaynay oo dhan. 16 Oo markaasay farriin u fareen
Yuusuf, oo waxay ku yidhaahdeen, Aabbahaa intuusan
dhiman ayuu dardaarmay oo wuxuu yidhi, 17 Waxaad
Yuusuf ku tidhaahdaan, Haatan waan ku baryayaaye, cafi
walaalahaa xadgudubkooda, iyo dembigooda, maxaa yeelay,
iyagu xumaan bay kugu sameeyeen. Haddaba waannu ku
baryaynaaye, Annagoo ah addoommada Ilaaha aabbahaa,
naga cafi xadgududkayaga. Yuusufuna wuu ooyay markay la
hadleen. 18 Walaalihiisna way u dhowaadeen oo ku hor
dhaceen; oo waxay yidhaahdeen, Bal eeg, waxaannu nahay
addoommadaada. 19 Markaasaa Yuusuf wuxuu iyagii ku
yidhi, Ha cabsanina, waayo, ma anaa Ilaah meeshiisii jooga?
20 Idinku xumaan baad ila damacsanaydeen, laakiinse
Ilaah wuxuu damacsanaa wanaag si uu u sameeyo siday
maantaba tahay oo uu dad badan badbaadiyo. 21 Haddaba
ha cabsanina. Anigu waan idin quudin doonaa idinka iyo
dhallaankiinnaba. Wuuna qalbi qaboojiyey oo si raxmad leh
ula hadlay. 22 Oo Yuusufna dalkii Masar buu degganaa,
isaga iyo reerkii aabbihiisba; oo wuxuu Yuusuf noolaa boqol
iyo toban sannadood. 23 Yuusufna qarnigii saddexaad
oo carruurtii Efrayim ayuu arkay; oo carruurtii Maakiir ina
Manasehna waxay ku kor dhasheen Yuusuf lowyihiisii. 24 Oo
Yuusuf wuxuu walaalihiis ku yidhi, Anigu waan dhimanayaa,
laakiinse hubaal Ilaah waa idin soo booqan doonaa, oo
dalkan idinka kaxayn doonaa, oo wuxuu idin geeyn doonaa
dalkii uu ugu dhaartay Ibraahim iyo Isxaaq iyo Yacquub.
25 Yuusuf wuxuu dhaariyey reer binu Israa'iil, oo ku yidhi,
Hubaal Ilaah waa idin soo booqan doonaaye, idinkuna waa
inaad lafahayga halkan ka qaaddaan. 26 Yuusufna wuxuu
dhintay isagoo boqol iyo toban sannadood jira; markaasaa
inta dawo meydkiisii la mariyey, waxaa lagu riday sanduuq
dalka Masar.

# Baxniintii

**1** Haddaba waa kuwan magacyadii wiilashii Israa'iil, oo
Masar yimid; nin walba iyo reerkiisiiba waxay la yimaadeen
Yacquub. **2** Ruubeen, Simecoon, Laawi iyo Yahuudah, **3**
Isaakaar, Sebulun, iyo Benyaamiin, **4** Daan iyo Naftaali,
iyo Gaad iyo Aasheer. **5** Oo dadkii ka soo go'ay xanjaadkii
Yacquub oo dhammu waxay ahaayeen toddobaatan qof;
Yuusufna Masar buu markii hore joogay. **6** Yuusufna, iyo
walaalihiis, iyo farcankaas oo dhanba way wada dhinteen. **7**
Oo reer binu Israa'iilna waa bateen, oo aad bay u kordheen,
wayna tarmeen, oo aad iyo aad u xoogaysteen; dhulkiina
way buuxiyeen. **8** Haddaba Masar waxaa ka kacay boqor
cusub oo aan Yuusuf aqoonin. **9** Markaasuu wuxuu dadkiisii
ku yidhi, Bal eega, dadkii reer binu Israa'iil waa inaga
badan yihiin, wayna inaga xoog weyn yihiin. **10** Kaalaya,
aynu si caqli ah ula macaamiloonnee; waaba intaasoo ay
tarmaan, oo ay markuu dagaal dhaco cadaawayaasheenna
inoogu darmadaan, oo intay inala diriraan ay dalka ka
baxaane. **11** Haddaba sidaas daraaddeed ayay niman
madax uga dhigeen si ay culaabtooda ugu dhibaan, oo
waxay Fircoon u dhiseen magaalooyin wax lagu kaydiyo
oo la yidhaahdo Fitom iyo Racmeses. **12** Laakiinse in
kastoo ay aad u dhibeen, haddana aad bay u sii tarmeen,
oo aad bay u faafeen. Oo reer binu Israa'iil aawadood
ayay la murugaysnaayeen. **13** Oo Masriyiintiina waxay reer
binu Israa'iil ku qasbeen inay qaxar ku adeegaan, **14** oo
waxay naftoodii ku dhibeen hawl aad u adag, oo ahayd
dhoobo la qaso, iyo leben, iyo hawl kasta oo beeraha laga
qabto, oo hawl kastoo ay ku qasbeen inay qabtaanba way
ku qaxri jireen. **15** Markaasaa boqorkii Masar wuxuu la
hadlay umulisooyinkii Cibraaniyadaha ahaa, oo middood
magaceeda Shifraah la odhan jiray, tan kale magaceedana
Fuwah la odhan jiray, **16** oo wuxuu ku yidhi, Markii aad
umulinaysaan naagaha Cibraaniyadaha, oo aad aragtaan
iyagoo gambarka umusha fadhiya, haddii uu wiil yahay, waa
inaad dishaan, haddayse gabadh tahay, ha iska noolaato. **17**
Laakiinse umulisooyinkii Ilaah bay ka cabsadeen, mana ay
samayn wixii boqorkii Masar ku amray, ee way badbaadiyeen
carruurtii labka ahayd. **18** Markaasaa boqorkii Masar u
yeedhay umulisooyinkii, oo wuxuu ku yidhi, Maxaad waxan u
samayseen, oo aad u badbaadiseen carruurtii labka ahayd?
**19** Markaasaa umulisooyinkii waxay Fircoon ku yidhaahdeen,
Maxaa yeelay, naagaha Cibraaniyaduhu la mid ma aha
naagaha Masriga, oo waa ka dhaqso badan yihiin, oo intii
aan umulisooyinku u iman bay umulaan. **20** Haddaba Ilaah
si wanaagsan buu u sameeyey umulisooyinkii, dadkiina waa
tarmay, oo aad bay u xoogaysteen. **21** Oo waxay noqotay,
in Ilaah umulisooyinkii reero u yeelay, maxaa yeelay, Ilaah
bay ka cabsadeen. **22** Markaasaa Fircoon wuxuu dadkiisii
ku amray, oo ku yidhi, Wiil kasta oo dhasha waa inaad
webiga ku tuurtaan, laakiinse gabadh kasta waa inaad
badbaadisaan.

**2** Markaasaa waxaa tegey nin reer Laawi ah, oo wuxuu
guursaday gabadh reer Laawi iyana ah. **2** Markaasay
naagtii uuraysatay oo waxay dhashay wiil; oo markay aragtay
inuu ilmo wanaagsan yahay, ayay qarisay in saddex bilood
ah. **3** Oo markay in dambe qarin kari weyday, ayay waxay
soo qaadday abxad caws duur ah, oo intay dhoobo iyo
daamur ku malaastay ayay wiilkii ku ridday, oo waxay dhex
gelisay duur webiga qarkiisa ka baxay. **4** Walaashiisna waxay
taagnayd meel ka fog, inay ogaato waxa isaga lagu samayn
doono. **5** Markaasaa gabadhii Fircoon webiga timid inay ku
maydhato. Gabdhihii addoommada u ahaana waxay socdeen
webigii dhinaciisa. Markaasay iyadu waxay aragtay abxadda
duurka ku dhex jirta, oo waxay u diratay gabadhii addoonta u
ahayd inay u keento. **6** Markaasay furtay, oo waxay aragtay
wiilkii; oo bal eeg, yarkii waa ooyay. Kolkaasay u naxariisatay,
oo waxay tidhi, Kanu waa carruurtii Cibraaniyada midkood.
**7** Markaasaa walaashiis waxay gabadhii Fircoon ku tidhi, Ma
kuugu yeedhaa naagaha Cibraaniyadaha middood inay kuu
nuujiso ilmaha? **8** Gabadhii Fircoonna waxay ku tidhi iyadii,
Haah, tag. Gabadhiina way tagtay oo waxay u yeedhay
yarkii hooyadiis. **9** Markaasaa gabadhii Fircoon waxay ku
tidhi iyadii, Tag, oo ilmahan qaad oo ii nuuji, oo anna waxaan
ku siin doonaa mushahaaradaada. Markaasay naagtii yarkii
qaadday oo nuujisay. **10** Yarkiina waa koray, markaasay u
keentay gabadhii Fircoon, oo wuxuu noqday wiilkeedii. Oo
waxay magiciisii u bixisay Muuse, oo waxay tidhi, Maxaa
yeelay, anaa biyihii ka soo bixiyey. **11** Oo waayahaas, markii
Muuse weynaaday, waxay noqotay inuu walaalihiis u soo
baxay, oo uu fiiriyey culaabta saaran. Markaasuu wuxuu
arkay mid Masri ah oo dilaya mid Cibraani ah oo walaalihiis
ka mid ah. **12** Markaasuu iska fiiriyey xagga iyo xagga,
oo markuu arkay inaan ciduna joogin ayuu Masrigii kaw
kaga siiyey, oo ciidda ku qariyey. **13** Markaasuu haddana
maalintii labaad soo baxay, oo wuxuu arkay laba nin oo
Cibraaniyo ah oo isla diriraya; oo kii gardarnaa buu wuxuu
ku yidhi, War maxaad u dilaysaa wadaygaa? **14** Markaasuu
wuxuu yidhi, Bal yaa amiir iyo xaakin nooga kaa dhigay? Ma
waxaad doonaysaa inaad ii disho sidaad u dishay Masriga?
Markaasaa Muuse cabsaday, oo wuxuu isyidhi, Hubaal wixii
waa la ogaaday. **15** Haddaba markii Fircoon waxaas maqlay,

ayuu wuxuu doondoonay inuu Muuse nafta ka qaado.
Laakiinse Muuse waa ka cararay Fircoon hortiisii, oo wuxuu
degay dalka Midyaan, oo ceel buu ag fadhiistay. 16 Haddaba
wadaadkii Midyaan wuxuu lahaa toddoba gabdhood. Intay
ceelkii yimaadeen ayay dhaamiyeen oo berkedihii biyo ka
buuxiyeen inay waraabiyaan idihii aabbahood. 17 Markaasaa
adhijirro yimaadeen oo ka eryeen, laakiinse Muuse intuu
istaagay, ayuu caawiyey iyagii, oo idahoodii u waraabiyey. 18
Oo markay u yimaadeen Recuu'eel oo aabbahood ah ayuu
wuxuu ku yidhi, Waa sidee, maanta waad soo dhaqsateene?
19 Markaasay waxay yidhaahdeen, Midkoo Masri ah ayaa
naga samatabbixiyey gacantii adhijirrada, oo weliba biyuu
noo dhaamiyey oo idaha isagaa noo waraabiyey. 20
Markaasuu wuxuu gabdhihiisii ku yidhi, Isagii meeyey?
De maxaad ninkii uga soo kacdeen? U yeedha, kibis ha
cunee. 21 Muusena raalli buu ka ahaa inuu ninkaas la
joogo, oo isagu wuxuu Muuse siiyey gabadhiisii Siforaah.
22 Oo waxay u dhashay wiil, markaasuu magiciisii wuxuu
u bixiyey Gershoom, waayo, wuxuu yidhi, Qariib baan ku
ahaa dal qalaad. 23 Oo waxay noqotay in waayahaas badan
dabadeed uu boqorkii Masar iska dhintay, reer binu Israa'iilna
addoonnimada aawadeed ayay ula taaheen, oo way ooyeen,
oo oohintoodiina waxay gaadhay Ilaah addoonnimada
aawadeed. 24 Ilaahna waa maqlay cabaadkoodii, markaasaa
Ilaah xusuustay axdigiisii uu la dhigtay Ibraahim, iyo Isxaaq,
iyo Yacquub. 25 Markaasaa Ilaah arkay reer binu Israa'iil,
Ilaahna wuu ogaaday xaalkoodii.

3 Muuse wuxuu ilaalinayay adhigii soddoggiis Yetroo
oo ahaa wadaadkii Midyaan, oo wuxuu adhigii u soo
kexeeyey meeshii cidlada ahayd shishadeeda, markaasuu
wuxuu yimid buurtii Ilaah oo ahayd Xoreeb. 2 Markaasaa
malaa'igtii Rabbigu waxay uga muuqatay dab ololaya oo
ka baxaya geed dhexdiis, kolkaasuu fiiriyey oo wuxuu
arkay geedkii oo ololaya oo dabku gubayo, geedkuna ma
basayn. 3 Markaasaa Muuse wuxuu yidhi, Anigu waan
ku leexan doonaa, waanan arki doonaa muuqashadan
weyn, iyo waxa geedku u guban waayay. 4 Oo markuu
Rabbigu arkay inuu ku soo leexday inuu arko ayaa Ilaah uga
yeedhay geedka dhexdiisii, oo wuxuu ku yidhi, Muusow,
Muusow. Markaasuu yidhi, Waa i kan. 5 Markaasuu wuxuu
ku yidhi, Halkan ha u soo dhowaan, kabahana iska siib,
waayo, meesha aad taagan tahay waa dhul quduus ah.
6 Oo weliba wuxuu kaloo ku yidhi, Anigu waxaan ahay
Ilaahii aabbahaa oo ah Ilaahii Ibraahim, iyo Ilaahii Isxaaq,
iyo Ilaahii Yacquub. Markaasaa Muuse wejigiisii qariyey,
waayo, wuxuu ka cabsaday inuu Ilaah eego. 7 Rabbiguna
wuxuu ku yidhi, Hubaal waxaan arkay dhibaatada dadkayga
ku haysata Masar, oo waan maqlay oohintii ay ooyeen
kuwa hawsha ku qaxraya aawadood, waayo, anigu waan
ogahay caloolxumadooda; 8 oo waxaan u imid inaan ka
samatabbixiyo gacanta Masriyiinta, iyo inaan ka soo bixiyo
dhulkaas, oo keeno dhul wanaagsan oo ballaadhan, oo
ah dal caano iyo malab la barwaaqaysan; waana meesha
ay deggan yihiin reer Kancaan, iyo reer Xeed, iyo reer
Amor, iyo reer Feris, iyo reer Xiwi, iyo reer Yebuus. 9
Oo haatan bal eeg, waxaa i hor timid oohintii reer binu
Israa'iil, oo weliba waxaan arkay cadaadinta ay Masriyiintu
ku cadaadinayaan iyaga. 10 Haddaba kaalay, oo waxaan
kuu dirayaa Fircoon, inaad dalka Masar ka soo kaxaysid
dadkayga reer binu Israa'iil ah. 11 Markaasaa Muuse wuxuu
Ilaah ku yidhi, Bal yaan ahay anigu, markaan Fircoon u
tegayo, oo aan reer binu Israa'iil ka soo bixinayo dalka
Masar? 12 Markaasuu wuxuu ku yidhi, Xaqiiqa anigaa kula
jiraya, oo taasaa calaamo kuu noqonaysa, inaan anigu ku
soo diray; markii aad dadka ka soo bixiso Masar, Ilaah baad
buurtan ugu adeegi doontaan. 13 Markaasaa Muuse wuxuu
Ilaah ku yidhi, Bal eeg, markii aan u tago reer binu Israa'iil,
oo aan ku idhaahdo iyaga, Ilaahii awowayaashiin baa ii soo
kiin diray, oo iyaga waxay igu odhan doonaan, De magiciisa
maxaa la yidhaahdaa? Haddaba maxaan ku odhan doonaa?
14 Markaasaa Ilaah wuxuu Muuse ku yidhi, ANIGU WAXAAN
AHAY KAAN AHAY; oo weliba wuxuu ku yidhi, Waxaad
ku odhan doontaa reer binu Israa'iil, WAAN AHAY baa ii
soo kiin diray. 15 Oo Ilaah weliba wuxuu kaloo Muuse ku
yidhi, Waxaad ku tidhaahdaa reer binu Israa'iil, Rabbiga ah
Ilaahii awowayaashiin, oo ah Ilaahii Ibraahim, iyo Ilaahii
Isxaaq, iyo Ilaahii Yacquub ayaa ii soo kiin diray; kanu waa
magacayga weligay, oo laygu xusuusto ka ab ka ab. 16
Bal tag, oo isu soo ururi waayeellada reer binu Israa'iil, oo
waxaad ku tidhaahdaa, Rabbiga ah Ilaahii awowayaashiin,
oo ah Ilaahii Ibraahim, iyo Ilaahii Isxaaq, iyo Ilaahii Yacquub
ayaa ii muuqday, isagoo leh, Hubaal waan idin soo booqday,
oo waan arkay waxa laydinku sameeyey Masar dhexdeeda,
17 oo waxaan idhi, Anigu waan idinka soo wadi doonaa
dhibaatada Masar, oo waxaan idin keeni doonaa dalka
reer Kancaan, iyo reer Xeed, iyo reer Amor, iyo reer Feris,
iyo reer Xiwi, iyo reer Yebuus, oo ah dal caano iyo malab
la barwaaqaysan. 18 Oo codkaaga way maqli doonaan,
markaas adiga iyo waayeellada reer binu Israa'iil waa inaad u
tagtaan boqorka Masar, oo waxaad ku tidhaahdaan, Rabbiga
ah Ilaaha Cibraaniyada ayaa nala kulmay. Haddaba waan ku
baryaynaaye, Iska kaaya daa aannu meel saddex maalmood
loo socdo oo cidla ah tagnee, inaannu allabari u bixinno

Rabbiga ah Ilaahayo. 19 Oo anna waxaan ogahay inaanu
boqorka Masar idiin sii daynayn inaad tagtaan, maya, ee
wuxuuna idiinku diidayaa gacan xoog leh. 20 Markaasaan
gacantayda soo kala bixin doonaa, oo waxaan Masar ku
layn doonaa cajaa'ibyadayda oo dhan oo aan ku dhex
samayn doono iyada, oo markaas dabadeed wuu idin sii
dayn doonaa inaad iska tagtaan. 21 Oo anigu dadkan raalli
baan uga yeeli doonaa Masriyiinta; oo waxay noqon doontaa
in markii aad tagtaan aydnaan faromadhnaan ku tegin, 22
laakiinse naag waluba ha weyddiisato deriskeeda iyo tan
guriga la joogta alaab lacag ah iyo alaab dahab ah, iyo dhar;
waxaadna saari doontaan wiilashiinna iyo gabdhihiinna, oo
waxaad dhici doontaan Masriyiinta.

4 Markaasaa Muuse jawaabay oo wuxuu yidhi, Laakiinse,
bal ogow, ima ay rumaysan doonaan, codkaygana ma ay
dhegaysan doonaan, waayo, waxay igu odhan doonaan,
Rabbigu kuuma uu muuqanin. 2 Markaasaa Rabbigu wuxuu
ku yidhi, Waa maxay waxaas gacantaada ku jiraa? Oo
wuxuu yidhi, Waa ul. 3 Markaasuu ku yidhi, Bal dhulka
ku tuur. Markaasuu dhulka ku tuuray, oo waxay noqotay
abeeso. Kolkaasaa Muuse ka hor cararay. 4 Markaasaa
Rabbigu wuxuu Muuse ku yidhi, Bal gacanta soo fidi oo
dabada ku dheg, kolkaasuu gacantii soo fidiyey oo dabada
ku dhegay, kolkaasay noqotay ul gacantiisa ku jirta. 5 Sidaas
yeel inay ku rumaystaan inuu kuu muuqday Rabbiga ah
Ilaahii awowayaashood, oo ah Ilaahii Ibraahim, iyo Ilaahii
Isxaaq, iyo Ilaahii Yacquub. 6 Oo Rabbigu wuxuu kaloo ku
sii yidhi isagii, Bal gacanta laabta saar, markaasuu gacanta
laabta saaray, oo markii uu ka qaaday, bal eeg, gacantii
baras bay yeelatay oo waxay u caddaatay sida baraf cad.
7 Markaasuu ku yidhi, Bal gacanta laabta mar kale saar.
Kolkaasuu mar kale gacantii laabta saaray, oo markii uu
ka qaaday laabtii, bal eeg, waxay haddana u rogmatay oo
u ekaatay sida jidhkiisii kale. 8 Oo waxay noqon doontaa,
hadday kugu rumaysan waayaan oo ay calaamada hore
codkeeda maqli waayaan, de markaas calaamada dambe
codkeeday rumaysan doonaan. 9 Oo haddana waxay noqon
doontaa, hadday rumaysan waayaan labadan calaamo, oo
weliba ay codkaaga maqli waayaan, de markaas bal waa
inaad webiga biyo ka qaaddid oo aad dhulka engegan ku
shubtid, oo biyihii aad webiga ka qaadday, markay gaadhaan
dhulka engegan dhiig bay noqon doonaan. 10 Markaasaa
Muuse wuxuu Rabbiga ku yidhi, Rabbiyow, anigu codkar ma
ahi, hadda iyo hore toona, iyo tan iyo markaad ila hadashay
anigoo addoonkaaga ah, maxaa yeelay, anigu hadalka waan
shigaa, waanan carrab la'ahay. 11 Markaasaa Rabbigu
wuxuu ku yidhi, Kan dadka afkiisa sameeyey waa ayo?
Yaase dadka carrab tira, ama dhego tira, ama wax tusa, ama
indho tira? Sow anigan Rabbiga ah ma aha? 12 Haddaba
sidaas daraaddeed tag, oo anigaa afkaaga la jiri doona oo
ku bari doona wixii aad ku hadli lahayd. 13 Isna wuxuu
yidhi, Rabbiyow, Waan ku baryayaaye, dir kaad doonaysid
inaad dirtid. 14 Markaasaa Rabbigu u cadhooday Muuse, oo
wuxuu ku yidhi, Sow ma joogo walaalkaa Haaruun oo ah reer
Laawi? Waan ogahay inuu isagu si wanaagsan u hadli karo.
Oo bal ogow, wuu u soo socdaa inuu kula kulmo, oo markuu
ku arko, qalbigiisuu ka farxi doonaa. 15 Haddaba waa inaad
isaga la hadashaa, oo aad erayada afkiisa ku riddaa, oo
anigu afkaagaan la jiri doonaa, iyo afkiisaba, oo waxaan idin
barayaa wixii aad samayn lahaydeen. 16 Oo isagu wuxuu
kuu noqon doonaa ninka dadka kuula hadla, oo waxay noqon
doontaa inuu isagu af kuu noqdo, adna waxaad isaga u
noqon doontaa Ilaah oo kale. 17 Haddaba waa inaad gacanta
ku qaadatid ushan aad cajaa'ibyada ku samayn doontid. 18
Markaasaa Muuse tegey oo wuxuu ku noqday soddoggiis
Yetroo, oo wuxuu ku yidhi, Waan ku baryayaaye, Bal i sii
daa aan tagee, oo ku noqdo walaalahayga Masar jooga, oo
aan soo arkee bal inay nool yihiin iyo in kale. Markaasaa
Yetroo wuxuu Muuse ku yidhi, Nabad ku tag. 19 Markaasaa
Rabbigu wuxuu ku yidhi Muuse, isagoo Midyaan jooga, Tag,
oo Masar ku noqo, waayo, dadkii doondoonayay inay nafta
kaa qaadaan way wada dhinteen. 20 Markaasaa Muuse
wuxuu watay naagtiisii iyo wiilashiisii, oo wuxuu saartay
dameer, wuxuuna ku noqday dalkii Masar. Markaasaa Muuse
ushii Ilaah gacanta ku qaatay. 21 Rabbiguna wuxuu Muuse
ku yidhi, Markii aad Masar ku noqotid, cajaa'ibyadii aan
gacantaada ku riday oo dhan Fircoon hortiisa ku samee,
laakiinse anigu qalbigiisaan qallafin doonaa, oo dadka ma
uu sii dayn doono inay tagaan. 22 Oo waxaad Fircoon ku
tidhaahdaa, Rabbigu wuxuu yidhi, Israa'iil waa wiilkayga
curadka ah, 23 oo waxaan adiga kugu idhi, Wiilkayga sii
daa, ha tagee oo ha ii adeegee. Adiguse waad u diiday
inuu tago. Bal hadda ogow, waxaan dili doonaa wiilkaaga
curadka ah. 24 Intay jidka sii socdeen meel bay ku habeen
dhexeen, Rabbi baana ugu yimid, oo wuxuu damcay inuu
dilo isaga. 25 Markaasaa Siforaah waxay qaadatay dhagax
af leh, oo wiilkeedii buuryadiisii bay ku gooysay, oo waxay ku
ag tuurtay cagihiisa oo tidhi, Hubaal waxaad ii tahay arooskii
dhiigga. 26 Markaasuu iska daayay isagii. Kolkaasay tidhi,
Waxaad ii tahay arooskii dhiigga gudniinta aawadeed. 27
Markaasaa Rabbigu wuxuu Haaruun ku yidhi, Tag inaad
Muuse kaga hor tagtid cidlada dhexdeeda. Markaasuu
tegey, oo wuxuu kaga hor tegey buurta Ilaah, kolkaasuu

dhunkaday. **28** Kolkaasaa Muuse wuxuu Haaruun u sheegay erayadii Rabbigu u soo faray oo dhan, iyo calaamooyinkii uu ku amray oo dhan. **29** Markaasaa Muuse iyo Haaruun tageen oo waxay isu soo ururiyeen waayeelladii reer binu Israa'iil oo dhan. **30** Markaasaa Haaruun kula hadlay erayadii Rabbigu Muuse u soo faray oo dhan, calaamooyinkiina dadka hortiisuu ku sameeyey. **31** Dadkiina way rumaysteen, oo markay maqleen inuu Rabbigu soo booqday reer binu Israa'iil iyo inuu arkay dhibaatadooda ayay madaxa hoos u foorariyeen oo caabudeen.

**5** Oo dabadeedna Muuse iyo Haaruun waxay u tageen Fircoon, oo waxay ku yidhaahdeen, Rabbiga ah Ilaaha reer binu Israa'iil wuxuu leeyahay, Sii daa dadkaygu ha tageene, inay cidlada iigu ciidaan. **2** Markaasaa Fircoon wuxuu yidhi, Waa ayo Rabbiga ay waajibka igu tahay inaan codkiisa maqlo oo aan reer binu Israa'iil sii daayo? Anigu garan maayo Rabbiga, oo weliba sii dayn maayo reer binu Israa'iil inay tagaan. **3** Markaasay waxay ku yidhaahdeen, Ilaahii Cibraaniyada ayaa nala kulmay, haddaba waannu ku baryaynaaye, Na sii daa, aannu tagnee meel cidla ah oo saddex maalmood loo socdo oo aan allabari ugu bixinnee Rabbiga ah Ilaahayaga inuusan belaayo ama seef nagu soo dejin. **4** Markaasaa boqorkii Masar wuxuu ku yidhi iyagii, Muuse iyo Haaruunow, maxaad dadka uga joojinaysaan shuqulladooda? Orda oo hawlihiinna culculus qabsada. **5** Kolkaasaa Fircoon wuxuu yidhi, Bal eega, haatan dadka dalku waa badan yihiin, oo idinku waad ka nasiseen hawlahoodii cuscuslaa. **6** Markaasaa Fircoon wuxuu isla maalintaas ku amray kuwii dadka hawsha ku cadaadin jiray iyo saraakiishoodii, isagoo leh, **7** Hadda dabadeed waa inaydnaan dadka siin caws ay leben ka sameeyaan sidii loo siin jiray, laakiinse iyagu ha tageen oo caws ha soo gurteen. **8** Oo lebenkii ay markii hore samayn jireen tiradiisii oo kale waa inaad hadda ka dib ku qasabtaan inay sameeyaan, oo waa inaydnaan waxba ka dhimin, waayo, waa caajisiin oo sidaas daraaddeed waxay u qaylinayaan, iyagoo leh, Na sii daa aannu tagnee oo aan Ilaahayaga allabari u bixinnee. **9** Haddaba nimanka ha lagu qasbo hawl ka culus intii hore inay ku hawshoodaan, oo yaanay hadal been ah u jeedin. **10** Markaasay kuwii hawsha dadka ku cadaadin jiray iyo saraakiishoodiiba dibadda u bexeen, oo waxay la hadleen dadkii, oo ku yidhaahdeen, Waxaa Fircoon idin leeyahay, Caws idin siin maayo. **11** Idinku taga oo caws ka doonta meeshii aad ka heli kartaan, laakiin hawshiinna waxba laydinka dhimi maayo innaba. **12** Sidaa daraaddeed ayaa dadku ku kala firdhay dalkii Masar oo dhan inay jirrido jajab ah soo ururiyaan meeshii cawska laga siin jiray. **13** Oo kuwii dadka hawsha ku cadaadin jirayna way daddajiyeen, oo waxay ku yidhaahdeen, Dhammeeya shuqulladiinna, iyo hawshiinna intii aad maalin walba samayn jirteen, sidii markii cawsku jiri jiray oo kale. **14** Oo saraakiishii reer binu Israa'iil, oo Fircoon kuwiisa dadka hawsha ku cadaadiyaa ay dadka madaxda uga dhigeen, waa la garaacay, oo waxaa lagu yidhi, War maxaad shalay iyo maantaba hawshiinna u dhammayn weydeen oo aad lebenkii ugu samayn weydeen sidii hore? **15** Markaasay saraakiishii reer binu Israa'iil waxay u tageen oo u cataabeen Fircoon, waxayna ku yidhaahdeen, War maxaad addoommadaada sidan ugula macaamilootaa? **16** Addoommadaada caws lama siiyo, oo waxay nagu yidhaahdaan, Leben sameeya. Oo bal eeg, addoommadaadii waa la garaacaa, laakiinse gardarrada waxaa iska leh dadkaaga. **17** Laakiinse wuxuu ku yidhi iyagii, Caajisiin baad tihiin, caajisiin baad tihiin, oo sidaas daraaddeed baad u leedihiin, Aannu tagno oo aan Rabbiga allabari u bixinno. **18** Haddaba taga oo shaqeeya, waayo, caws laydin siin maayo, oo weliba waa inaad keentaan tiradii lebenkii oo kale. **19** Oo saraakiishii reer binu Israa'iil waxay arkeen in xaalkoodii xun yahay, markii lagu yidhi, Waa inaydnaan waxba dhimin lebenkii aad maalin walba samayn jirteen. **20** Oo markay Fircoon ka soo bexeen waxay ka hor yimaadeen Muuse iyo Haaruun oo jidka taagtaagan, **21** oo waxay ku yidhaahdeen, Rabbigu ha idin fiiriyo oo ha idin xukumo, waayo, waxaad naga dhigteen wax u ura Fircoon iyo addoommadiisii si ay noo nacaan oo ay intay seefo noo qaataan noo laayaan. **22** Markaasaa Muuse mar kale Rabbiga u jeestay, oo wuxuu ku yidhi, Rabbiyow, maxaad dadkan si xun ugula macaamilootay? Oo maxaad aniga ii soo dirtay? **23** Ilaa markii aan u imid Fircoon oo aan magacaaga kula hadlay isaga, wax xun buu dadkan ku sameeyey, oo adna dadkaaga kama aad samatabbixin innaba.

**6** Markaasaa Rabbigu wuxuu Muuse ku yidhi, Haddaba waad arki doontaa waxaan ku samayn doono Fircoon, waayo, gacan xoog leh buu ku sii dayn doonaa iyaga, oo gacan xoog leh buu dhulkiisa kaga eryi doonaa. **2** Markaasaa Ilaah wuxuu la hadlay Muuse oo ku yidhi, Anigu waxaan ahay Rabbiga, **3** oo waxaan ugu muuqday Ibraahim, iyo Isxaaq, iyo Yacquub, sidii Ilaaha Qaadirka ah, laakiinse magacayga ah RABBI iguma ay aqoonin. **4** Oo weliba axdigaygii waan la dhigtay iyaga inaan siiyo dalka reer Kancaan oo ah dalkii geeddinimadooda oo ay qariibka ku ahaayeen. **5** Oo weliba waxaan maqlay cabaadka reer binu Israa'iil oo Masriyiintu

addoonsiga ku sii hayaan, oo axdigaygii baan xusuustay. 6
Haddaba waxaad reer binu Israa'iil ku tidhaahdaa, Anigu
waxaan ahay Rabbiga, oo waan idinka soo bixin doonaa
culaabta Masriyiintu idinku hoos hayaan, waanan idinka
xorayn doonaa addoonsigooda, waanan idinku furan doonaa
gacan fidsan iyo xukummo waaweyn, 7 oo waxaan idiin
qaadan doonaa dad ahaan, oo aan idiin noqon doonaa
Ilaah, oo waxaad ogaan doontaan inaan anigu ahay Rabbiga
Ilaahiinna ah oo idinka bixinaya culaabtii Masriyiinta. 8 Oo
waxaan idin geeyn doonaa dalkii aan ku dhaartay inaan
siiyo Ibraahim, iyo Isxaaq, iyo Yacquub, oo idinkaan dhaxal
ahaan idiin siin doonaa. Anigu waxaan ahay Rabbiga. 9
Muusena sidaasuu reer binu Israa'iil ula hadlay, laakiinse ma
ayan maqlin Muuse, caloolxumadooda iyo addoonsiga aan
looga tudhayn aawadood. 10 Markaasaa Rabbigu Muuse la
hadlay, isagoo leh, 11 Fircoon oo ah boqorka Masar u tag,
oo la hadal, si uu u sii daayo reer binu Israa'iil si ay dalkiisa
uga baxaan. 12 Markaasaa Muuse Rabbiga la hadlay oo
wuxuu ku yidhi, Bal eeg, reer binu Israa'iil ima maqline, de
haddaba sidee buu Fircoon ii maqli doonaa, anigoo aan
bushimaha ka xalaalaysnayn? 13 Markaasaa Rabbigu wuxuu
la hadlay Muuse iyo Haaruun, oo amar buu u soo faray
reer binu Israa'iil, iyo boqorkii Masar oo ahaa Fircoon, inay
reer binu Israa'iil ka soo wadaan dalka Masar. 14 Kuwanu
waa madaxdii reerihii awowayaashood, kuwanu waa reer
Ruubeen oo ahaa curadkii Israa'iil, Xanoog, iyo Falluu, iyo
Xesroon, iyo Karmii; kuwanu waa qolooyinkii reer Ruubeen.
15 Reer Simecoonna waa kuwan, Yemuu'eel, iyo Yaamiin, iyo
Ohad, iyo Yaakiin, iyo Sohar, iyo Shaa'uul oo ahaa wiilkii ay
naag reer Kancaan ah dhashay. Kuwanu waa qolooyinkii reer
Simecoon. 16 Kuwanuna waa reer Laawi magacyadoodii,
iyo sidii farcankoodii kala ahaayeen; Gershoon, iyo Qohaad,
iyo Meraarii. Oo Laawi cimrigiisii wuxuu ahaa boqol iyo
toddoba iyo soddon sannadood. 17 Reer Gershoon, iyo sidii
qolooyinkoodu kala ahaayeenna waa Libnii iyo Shimcii. 18
Reer Qohaadna waa Camraam, iyo Isehaar, iyo Xebroon,
iyo Cusii'eel. Oo Qohaad cimrigiisiina wuxuu ahaa boqol
iyo saddex iyo soddon sannadood. 19 Reer Meraariina
waa Maxlii iyo Mushii. Kuwanu waa qolooyinkii reer Laawi
iyo sidii ay farcankoodii kala ahaayeen. 20 Oo Camraam
wuxuu guursaday Yookebed oo eeddadiis ahayd, oo waxay
u dhashay Haaruun iyo Muuse. Oo Camraam cimrigiisiina
wuxuu ahaa boqol iyo toddoba iyo soddon sannadood. 21
Reer Isehaarna waa Qorax, iyo Nefeg, iyo Sikrii. 22 Reer
Cusii'eelna waa Miishaa'eel, iyo Elsaafaan, iyo Sitrii. 23
Haaruunna wuxuu guursaday Eliishebac ina Cammiinaadaab
oo ahayd Naxshoon walaashiis; oo waxay u dhashay
Naadaab iyo Abiihuu, iyo Elecaasaar, iyo Iitaamaar. 24 Reer
Qoraxna waa Asiir, iyo Elqaanaah, iyo Abii'aasaaf. Kuwanu
waa qolooyinkii reer Qorax. 25 Markaasaa Elecaasaar oo
ahaa ina Haaruun wuxuu guursaday gabdhihii Fuutii'eel
middood, oo waxay u dhashay Fiinexaas. Kuwanu waa
madaxdii reer Laawi, iyo qolooyinkoodii siday kala ahaayeen.
26 Kuwanu waa Haaruun iyo Muuse kuwii Rabbigu ku
yidhi, Reer binu Israa'iil ka soo wada dalka Masar sida
ay dadkooda guutooyinkoodu yihiin. 27 Kuwanuna waa
kuwii la hadlay boqorkii Masar oo Fircoon ahaa, inuu dalka
Masar ka bixiyo reer binu Israa'iil. Iyagu waa Muusahaas
iyo Haaruunkaas. 28 Maalintii Rabbigu la hadlay Muuse
oo dalka Masar jooga, 29 wuxuu Rabbigu ku yidhi Muuse,
Anigu waxaan ahay Rabbiga. Boqorka Masar oo Fircoon ah
la hadal oo waxaad u sheegtaa wixii aan kugula hadlo oo
dhan. 30 Markaasaa Muuse wuxuu ku yidhi Rabbiga, Bal
eeg, anigu bushimaha kama xalaalaysni, de haddaba sidee
buu Fircoon ii maqlayaa?

**7** Markaasaa Rabbigu wuxuu Muuse ku yidhi, Bal fiiri,
waxaan Fircoon kaaga dhigay sidii ilaah oo kale, walaalkaa
Haaruunna wuxuu ahaan doonaa nebigaaga. 2 Adigu waa
inaad ku hadasho waxa aan kugu amrayo oo dhan; walaalkaa
Haaruunna waa inuu Fircoon la hadlo si uu reer binu
Israa'iil u sii daayo si ay dalkiisa uga baxaan. 3 Oo Fircoon
qalbigiisana waan qallafin doonaa, calaamooyinkayga iyo
cajaa'ibyadaydana waan ku badin doonaa dalka Masar. 4
Laakiin Fircoon kuma maqli doono, markaasaan gacantayda
saari doonaa Masar, oo aan soo bixin doonaa ciidankayga
oo ah dadkayga reer binu Israa'iil, waanan kaga soo saari
doonaa xukummo waaweyn dalka Masar. 5 Markaasaa
Masriyiintu ogaan doonaan inaan anigu Rabbiga ahay, markii
aan gacantayda Masar ku kor fidiyo, oo aan reer binu Israa'iil
ka dhex bixiyo iyaga. 6 Markaasaa Muuse iyo Haaruun
sidaas yeeleen. Sidii Rabbigu ku amray, ayay yeeleen.
7 Muusena markaas wuxuu jiray siddeetan sannadood,
Haaruunna wuxuu jiray saddex iyo siddeetan sannadood
markay Fircoon la hadleen. 8 Markaasaa Rabbigu la hadlay
Muuse iyo Haaruun, oo wuxuu ku yidhi, 9 Markii Fircoon
idinla hadlo, oo idinku yidhaahdo, Cajaa'ib i tusa; markaas
waxaad Haaruun ku tidhaahdaa, Ushaada qaado, oo Fircoon
hortiisa ku tuur, si ay abeeso u noqoto. 10 Markaasaa Muuse
iyo Haaruun waxay u tageen Fircoon, oo waxay yeeleen sidii
Rabbigu ku amray, markaasaa Haaruun ushiisii ku hor tuuray
Fircoon iyo addoommadiisii, oo waxay noqotay abeeso. 11
Fircoonna markaasuu wuxuu u yeedhay raggiisii xigmadda
lahaa iyo saaxiriintiisii, markaasaa falalowyadii Masarna

iyana yeeleen sidii si le'eg oo falfalkoodii ku sameeyeen.
12 Waayo, nin waluba wuxuu tuuray ushiisii, markaasay
waxay noqdeen abeesooyin, laakiinse ushii Haaruun baa
wada liqday ulahoodii oo dhan. 13 Qalbigii Fircoonna wuu sii
qallafsanaaday, mana uu dhegaysan iyagii, sidii Rabbigu
yidhi. 14 Markaasaa Rabbigu wuxuu Muuse ku yidhi, Fircoon
waa macangag, oo wuu diidayaa inuu dadka sii daayo. 15 Bal
subaxda Fircoon u tag, waayo, aroorta wuxuu tagaa biyaha.
Haddaba waxaad istaagtaa webiga qarkiisa inaad la kulantid
isaga; oo gacanta waxaad ku qaadataa ushii abeesada
noqotay. 16 Oo waxaad isaga ku tidhaahdaa, Rabbiga
ah Ilaaha Cibraaniyada ayaa ii soo kaa diray, oo wuxuu
kugu yidhi, Sii daa dadkaygu ha tageene, inay cidlada iigu
adeegaan; oo bal eeg, hadda ka hor ima aad maqlin. 17 Oo
waxaa Rabbigu ku leeyahay, Tan ayaad ku ogaan doontaa
inaan Rabbiga ahay, bal ogow, ushan aan gacanta ku hayo
ayaan ku dhufan doonaa biyaha webiga ku jira, markaasay
waxay u rogman doonaan dhiig. 18 Oo kalluunka biyaha ku
jiraana way wada bakhtiyi doonaan, markaasaa webigu soo
uri doonaa; kolkaasaa Masriyiintu aad u nebcaan doonaan
inay webiga biyo ka cabbaan. 19 Rabbigu wuxuu Muuse ku
yidhi, Waxaad Haaruun ku tidhaahdaa, Ushaada qaado,
oo gacanta ku kor fidi biyaha Masar, iyo webiyaashooda,
iyo durdurradooda, iyo galalkooda, iyo balliyadooda biyaha
ah oo dhan, si ay u noqdaan dhiig; oo dhulka Masar oo
dhammu wuxuu noqon doonaa dhiig miidhan, oo ku jiri
doona weelasha qoriga ah iyo weelasha dhagaxa ahba.
20 Markaasaa Muuse iyo Haaruun yeeleen sidii Rabbigu
ku amray; kolkaasuu ushii kor u qaaday, oo biyihii webiga
ku jiray ku dhuftay Fircoon iyo addoommadiisii hortooda,
markaasaa biyihii webiga ku jiray oo dhammu waxay u
rogmadeen dhiig. 21 Kalluunkii webiga ku jirayna way wada
bakhtiyeen; webigiina waa uray, Masriyiintiina biyo way ka
cabbi kari waayeen webigii; dhulkii Masar oo dhammuna
wuxuu noqday dhiig miidhan. 22 Markaasaa saaxiriintii
Masarna waxay yeeleen sidii si le'eg oo falfalkoodii ku
sameeyeen. Qalbigii Fircoonna wuu sii qallafsanaaday,
mana uu dhegaysan iyagii, sidii Rabbigu yidhi. 23 Kolkaasaa
Fircoon noqday oo gurigiisii tegey, waxanna qalbigiisii maba
uu gelin. 24 Markaasaa Masriyiintii oo dhammu waxay qoteen
webiga dhinacyadiisa inay helaan biyo ay cabbaan, waayo,
biyihii webiga way cabbi kari waayeen. 25 Oo intii Rabbigu
webiga kharribay toddoba maalmood baa ka dambaysay.

8 Markaasaa Rabbigu wuxuu Muuse ku yidhi, Fircoon u
tag, oo waxaad ku tidhaahdaa, Waxaa Rabbigu leeyahay,
Dadkayga sii daa ha tageene inay ii adeegaan. 2 Oo haddii
aad diiddo inaad sii daysid, bal hadda ogow, waddankaaga oo
dhan waxaan ku soo dayn doonaa rahyo. 3 Oo webiga waxaa
ka buuxsami doona rahyo, markaasay waxay tegi doonaan
oo geli doonaan gurigaaga, iyo qawladdaada aad seexatid,
iyo sariirtaada dusheeda, iyo guryaha addoommadaada
oo dhan, iyo dadkaaga dushiisa, iyo foornooyinkaaga
dhexdooda, iyo weelashaada wax lagu cajiimo oo dhan; 4 oo
rahyadu waxay kor fuuli doonaan adiga, iyo dadkaaga, iyo
addoommadaada oo dhanba. 5 Markaasaa Rabbigu wuxuu
Muuse ku yidhi, Waxaad Haaruun ku tidhaahdaa, Gacanta
adoo ushaada ku haysta ku fidi webiyaasha dushooda, iyo
durdurrada dushooda, iyo balliyada dushooda, oo rahyo ku
soo daa dalka Masar. 6 Markaasaa Haaruun gacanta ku kor
fidiyey biyihii dalka Masar oo dhan, kolkaasaa rahyadii soo
baxeen oo qariyeen dalkii Masar. 7 Saaxiriintiina sidaas si
le'eg bay yeeleen oo falfalkoodii ku sameeyeen, oo rahyo
bay keeneen dalkii Masar. 8 Markaasaa Fircoon wuxuu u
yeedhay Muuse iyo Haaruun, oo wuxuu ku yidhi, Rabbiga
noo barya inuu rahyada naga qaado aniga iyo dadkaygaba;
oo markaasaan dadka sii dayn doonaa inay tagaan oo ay
Rabbiga allabari u bixiyaan. 9 Kolkaasaa Muuse wuxuu
Fircoon ku yidhi, Adaa amarka leh; goormaan idiin baryaa
adiga iyo addoommadaada iyo dadkaaga, iyo in rahyada
laga baabbi'iyo adiga iyo guryahaagaba, oo ay ku hadhaan
webiga keliya? 10 Markaasuu ku yidhi, Berri. Isaguna wuxuu
yidhi, Sidaad u tidhi ha noqoto, bal inaad ogaatid inaanu jirin
mid la mid ah Rabbiga ah Ilaahayaga. 11 Oo rahyadu waa ka
tegi doonaan adiga iyo guryahaaga, iyo addoommadaada,
iyo dadkaagaba, oo waxay ku hadhi doonaan webiga oo
keliya. 12 Kolkaasay Muuse iyo Haaruun ka tageen Fircoon;
markaasaa Muuse Rabbiga ugu qayshaday wax ku saabsan
rahyadii uu ku soo daayay Fircoon. 13 Rabbiguna wuu
yeelay siduu Muuse yidhi, oo rahyadii waa ka idlaadeen
guryihii, iyo barxadihii, iyo beerihiiba. 14 Kolkaasay isu soo
wada ururiyeen oo meelo ku tuuleen, markaasaa dalkii
uray. 15 Fircoonse markuu arkay inay wixii joogsadeen ayuu
qalbiga ka sii qallafsanaaday, mana uu dhegaysan iyagii,
sidii Rabbigu yidhi. 16 Markaasaa Rabbigu wuxuu Muuse
ku yidhi, Waxaad Haaruun ku tidhaahdaa, Ushaada fidi oo
ciidda dhulka ku dhufo si uu dalka Masar oo dhammu injir
miidhan u noqdo. 17 Markaasay sidii yeeleen. Kolkaasaa
Haaruun ushiisii gacanta ku fidiyey, oo wuxuu ku dhuftay
ciidda dhulka, kolkaasaa injiru gashay dadkii iyo duunyadiiba;
ciiddii dhulka oo dhammuna waxay noqotay injir miidhan oo
qulqulaysa dalkii Masar oo dhan. 18 Saaxiriintiina saasay
yeeleen, oo waxay damceen inay injir falfalkoodii ku keenaan,
laakiinse way kari waayeen; injir baana ku jirtay dadkii iyo

duunyadiiba. 19 Markaasaa saaxiriintii waxay Fircoon ku
yidhaahdeen, Tanu waa fartii Ilaah. Qalbigii Fircoonna wuu
sii qallafsanaaday, mana uu dhegaysan iyagii, sidii Rabbigu
yidhi. 20 Markaasaa Rabbigu wuxuu Muuse ku yidhi, Aroor
hore kac oo Fircoon hortiisa istaag, waayo, markaasuu
biyaha tegayaa, oo waxaad ku tidhaahdaa, Waxaa Rabbigu
leeyahay, Dadkayga sii daa ha tageene inay ii adeegaan. 21
Haddii kalese haddaadan dadkayga sii daynin inay tagaan,
bal ogow, waxaan idiin soo diri doonaa duqsiyo faro badan,
adiga, iyo addoommadaada, iyo dadkaaga, iyo guryahaaga
dhexdooda; oo guryaha Masriyiinta oo dhanna waxaa ka
buuxsami doona duqsiyo faro badan, iyo weliba dhulka ay
joogaanba. 22 Inaad ogaatid inaan anigu dhulka dhexdiisa
ku ahay Rabbiga, maalintaas waan ka duwi doonaa dalka
Goshen oo dadkaygu deggan yahay, inaan duqsiyo badanu
halkaas jirin innaba. 23 Oo dadkayga iyo dadkaagana
waan kala sooci doonaa; calaamadaasuna berri bay ahaan
doontaa. 24 Rabbiguna sidii buu yeelay, oo duqsiyo badan oo
baas ayaa yimid gurigii Fircoon, iyo guryihii addoommadiisa,
oo dalkii Masar oo dhanna duqsiyadii badnaa aawadood
ayuu u kharribmay. 25 Markaasaa Fircoon wuxuu u yeedhay
Muuse iyo Haaruun, oo wuxuu ku yidhi, Taga oo Ilaahiin dalka
dhexdiisa allabari ugu bixiya. 26 Kolkaasaa Muuse ku yidhi,
Sidaas inaan yeelno ma habboona; waayo, karaahiyada
Masriyiinta ayaannu Rabbiga Ilaahayaga ah u bixinaynaa.
Bal eeg, miyaannu karaahiyada Masriyiinta ku allabarinnaa
iyagoo noo jeeda? De sow na dhagxin maayaan? 27 Meel
saddex maalmood loo socdo oo cidla ah ayaannu tegaynaa,
oo allabari ugu bixinaynaa Rabbiga Ilaahayaga ah, siduu
nagu amri doono. 28 Markaasaa Fircoon wuxuu ku yidhi,
Waan idin sii daynayaa inaad tagtaan inaad cidlada allabari
ugu bixisaan Rabbiga Ilaahiinna ah, laakiinse waa inaydnaan
aad u fogaan. Iina soo duceeya. 29 Muusena wuxuu ku
yidhi, Bal eeg, waan kaa baxayaa oo waxaan Rabbiga
ka baryi doonaa inay duqsiyada badanu berri ka tagaan
Fircoon iyo addoommadiisa, iyo dadkiisa, laakiinse Fircoon
yuusan mar dambe khiyaano nagula macaamiloon, isagoo
aan daynin dadka inay tagaan si ay allabari ugu bixiyaan
Rabbiga. 30 Markaasaa Muuse ka tegey Fircoon, oo wuxuu
baryay Rabbiga. 31 Rabbiguna sidii Muuse yidhi ayuu
yeelay; duqsiyadii badnaana wuu ka kexeeyey Fircoon, iyo
addoommadiisii, iyo dadkiisiiba. Mid qudh ahna kama hadhin.
32 Markanna Fircoon qalbiga ayuu ka sii qallafsanaaday, oo
dadkiina siima uu dayn inay tagaan.

9 Markaasaa Rabbigu wuxuu Muuse ku yidhi, Fircoon
u tag, oo waxaad ku tidhaahdaa, Waxaa Rabbiga ah
Ilaaha Cibraaniyadu leeyahay, Dadkayga sii daa ha tageene,
inay ii adeegaan. 2 Waayo, haddii aad sii dayn weydo,
oo aad sii haysatid, 3 bal ogow, gacanta Rabbigu waxay
ku dhici doontaa xoolahaaga berrinka jooga, ha ahaadeen
fardaha, dameeraha, geela, lo'da, iyo adhigaba; waxaana
dhici doona cudur baas. 4 Oo Rabbigu waa kala sooci
doonaa xoolaha reer binu Israa'iil iyo xoolaha Masar; oo
waxa reer binu Israa'iil ay leeyihiinna waxba kama dhiman
doonaan. 5 Rabbiguna wakhti buu u qabtay, isagoo leh, Berri
Rabbigu waxan ayuu dalka dhexdiisa ku samayn doonaa.
6 Rabbiguna waxaas waa sameeyey maalintii dambe, oo
xoolihii Masar oo dhammuna way wada bakhtiyeen; laakiinse
xoolihii reer binu Israa'iil midna kama bakhtiyin. 7 Markaasaa
Fircoon cid diray, oo bal eeg, xoolihii reer binu Israa'iil xataa
mid kama bakhtiyin. Laakiinse Fircoon wuu madax adkaaday,
dadkiina siima uu dayn inay tagaan. 8 Markaasaa Rabbigu
wuxuu Muuse iyo Haaruun ku yidhi, Waxaad qaadataan
cantoobooyin dambaska foornada ah, oo Muuse samada
ha u saydho Fircoon hortiisa. 9 Oo waxay noqon doontaa
habaas dhulka Masar oo dhan dul yaal, oo dalka Masar
oo dhan waxaa dadka iyo duunyadaba ka soo bixi doona
boogo xunxun. 10 Markaasay qaadeen dambaskii foornada,
oo waxay hor istaageen Fircoon; kolkaasaa Muuse xagga
samada kor ugu saydhay, markaasaa dadkii iyo duunyadiiba
waxaa ka soo wada baxay boogo xunxun. 11 Oo saaxiriintiina
Muuse ma ay hor istaagi karin boogaha dartood, waayo,
booguhu waxay ka soo bexeen saaxiriintii iyo Masriyiintii oo
dhan. 12 Rabbiguna waa sii qallafiyey Fircoon qalbigiisii, oo
isna ma uu dhegaysan iyagii, sidii Rabbigu Muuse ku yidhi.
13 Markaasaa Rabbigu wuxuu Muuse ku yidhi, Aroor hore
kac, oo Fircoon hortiisa istaag, oo waxaad ku tidhaahdaa,
Rabbiga Ilaaha Cibraaniyada ah wuxuu leeyahay, Dadkayga
sii daa ha tageene, inay ii adeegaan. 14 Waayo, waxaan
markan qalbigaaga, iyo addoommadaada, iyo dadkaagaba
ku soo dayn doonaa belaayadayda oo dhan, inaad ogaatid
inaan dhulka oo dhan lagu arag mid anoo kale ah. 15 Waayo,
haatan haddaan gacantayda fidin lahaa, oo aan belaayo
kugu dhufan lahaa adiga iyo dadkaagaba, de markaas
adiga dhulka waa lagaa baabbi'in lahaa, 16 laakiin sababtan
aawadeed ayaan kuu taagay, inaan xooggayga kaa muujiyo
iyo in magacayga laga sheego dhulka oo dhan. 17 Ma weli
baad dadkayga iska weynaynaysaa, oo aanad sii daynin?
18 Bal ogow, berrito haddaa oo kale waxaan soo daadin
doonaa roobdhagaxyaale baas oo aan weligiis lagu arag
Masar tan iyo maalintii la dhisay ilaa haatan. 19 Haddaba cid
u dir oo la soo dhaqso lo'daada iyo waxa berrinka kuu jooga
oo dhan; waayo, dad iyo duunyo wixii berrinka laga helo

oo dhan oo aan guryaha la soo gelin, waxaa ku soo degi
doona roobka dhagaxyada leh, wayna dhiman doonaan.
20 Markaasaa mid kasta oo addoommadii Fircoon ka mid
ahaa oo ka cabsanayay ereygii Rabbiga, addoommadiisii
iyo lo'diisii ayuu xagga guryaha u eryay; 21 kii aan dan
ka lahayn ereygii Rabbigase addoommadiisii iyo lo'diisiiba
ayuu berrinka ku daayay. 22 Markaasaa Rabbigu wuxuu
Muuse ku yidhi, Gacanta xagga samada u fidi, in roobka
dhagaxyada leh ku soo dego dalka Masar oo dhan, dadka
dushiisa iyo duunyada dusheeda iyo dhalatada duurka ku
taal dusheeda oo dhan ee dalka Masar dhammaantiis.
23 Markaasaa Muuse ushiisii u fidiyey xagga samada, oo
Rabbigu wuxuu soo diray onkod iyo roobdhagaxyaale,
waxaana dhulka ku soo degay dab; oo Rabbigu wuxuu
dalkii Masar ku soo daayay roobdhagaxyaale. 24 Sidaas
daraaddeed waxaa ku soo da'ay roobdhagaxyaale baas,
roobka dhagaxyada lehna waxaa ku qaldanaa dab, kaas
oo kalena weligiis kama di'in dalka Masar oo dhan tan
iyo maalintii ay quruun noqotay ilaa haatan. 25 Oo roobkii
dhagaxyada lahaana wuxuu laayay wax alla wixii dalka
Masar oo dhan duurkiisa joogay, dad iyo duunyoba; oo
dhalatadii duurka oo dhanna roobkii dhagaxyada lahaa baa
laayay, oo dhirtii duurka oo dhanna wuu jejebiyey. 26 Waxaa
keliyahoo aan roobdhagaxyaale ku di'in dalkii Goshen oo
reer binu Israa'iil joogeen. 27 Markaasaa Fircoon cid u
diray, oo u yeedhay Muuse iyo Haaruun, oo wuxuu iyagii
ku yidhi, Markan waan dembaabay; Rabbigu waa xaq,
aniga iyo dadkaygubana shar baannu leennahay. 28 Bal
Rabbiga noo barya, waayo, roobkan dhagaxyada leh iyo
onkodkan weynu waa nagu filan yihiin; oo waan idin sii dayn
doonaa, oo idinku mar dambe sii joogi maysaan innaba. 29
Kolkaasaa Muuse wuxuu isagii ku yidhi, Isla markii aan ka
baxo magaalada ayaan gacmahayga u kala bixin doonaa
Rabbiga, oo onkodku waa joogsan doonaa, roobdhagaxyaale
dambena ma jiri doono, si aad adigu u ogaatid inuu Rabbigu
dhulka leeyahay. 30 Laakiin waan ogahay in adiga iyo
addoommadaadu aydnaan weli ka cabsanayn Rabbiga
Ilaaha ah. 31 Oo cudbigii iyo shaciirkiiba waa baabbe'een;
waayo, shaciirku waa midhaystay, cudbigana ubax baa
ka baxayay. 32 Laakiinse sarreenkii waxba kuma dhicin;
waayo, weli aad uma uu bixin. 33 Oo Muusena magaaladii
buu ka baxay, wuuna ka tegey Fircoon, oo gacmihiisii buu
u kala bixiyey Rabbiga. Markaasaa onkodkii iyo roobkii
dhagaxyada lahaaba joogsadeen, roobkiina dhulka kuma
shubmin. 34 Fircoonna kolkuu arkay inay joogsadeen
roobkii iyo roobdhagaxyaalihii iyo onkodkiiba, ayuu weliba
sii dembaabay, oo qalbigiisiina wuu sii qallafiyey, isaga
iyo addoommadiisiiba. 35 Oo Fircoon qalbigiisiina waa sii
qallafsanaaday, oo reer binu Israa'iilna siima uu dayn inay
tagaan, sidii Rabbigu Muuse afkiisa kaga hadlay.

10 Kolkaasaa Rabbigu Muuse ku yidhi, Orod oo Fircoon
u gal, waayo, qalbigiisii waan qallafiyey, iyo qalbiyadii
addoommadiisa, inaan calaamooyinkaygan dhexdooda ka
muujiyo, 2 iyo inaad adigu u sheegtid dhegaha wiilkaaga,
iyo wiilkaaga wiilkiisa, wixii aan ku sameeyey Masriyiinta,
iyo calaamooyinkaygii aan ku dhex sameeyey, inay iyagu
ogaadaan inaan anigu ahay Rabbiga. 3 Markaasaa
Muuse iyo Haaruun waxay u tageen Fircoon, oo ku
yidhaahdeen, Rabbiga ah Ilaaha Cibraaniyadu wuxuu
kugu yidhi, Ilaa goormaad diidaysaa inaad hortayda is-
hoosaysiiso? Dadkayga sii daa ha tageene, inay ii adeegaan.
4 Laakiinse haddii aad diiddo inaad dadkayga sii dayso, bal
ogow, berrito dalkaaga ayax baan ku soo dayn doonaa, 5 oo
dhulkuu qarin doonaa, si aan dhulka loo arkin, oo wuxuu
cuni doonaa wixii ka baxsaday roobkii dhagaxyada lahaa oo
idiin hadhay, oo wuxuu kaloo cuni doonaa geed kasta oo
duurka idiinka baxaya. 6 Oo wuxuu ka buuxsami doonaa
guryahaaga, iyo guryaha addoommadaada, iyo guryaha
Masriyiinta oo dhan; si aan aabbayaashiin iyo awowayaashiin
midkoodna arag tan iyo waagii ay dhulka joogeen ilaa
maantadan. Kolkaasuu ka noqday oo ka tegey Fircoon. 7
Markaasaa Fircoon addoommadiisii waxay ku yidhaahdeen,
Ilaa goormuu ninkanu dabin inagu noqonayaa? Inaga sii
daa nimanka, Rabbiga Ilaahooda ah ha u adeegeene. War
miyaadan weli ogayn in Masar baabba'day? 8 Markaasaa
Muuse iyo Haaruun mar kale loo keenay Fircoon. Kolkaasuu
wuxuu ku yidhi, Taga oo Rabbiga Ilaahiinna ah u adeega,
laakiinse waa ayo kuwa tegayaa? 9 Muusena wuxuu yidhi,
Annagu waannu tegaynaa yar iyo weynba, oo waxaannu la
tegaynaa wiilashayada iyo gabdhahayaga, iyo adhyahayaga,
iyo lo'dayada oo dhan; waayo, waxaannu u iidaynaa
Rabbigayaga. 10 Oo wuxuu iyagii ku yidhi, Rabbigu ha
idinla jiro, haddaan idin sii daayo idinka iyo yaryarkiinnaba,
laakiinse bal ogaada in wax xumu idinka horreeyaan. 11
Sidaas ma aha; ee intiinna ragga ahu taga, oo Rabbiga u
adeega; waayo, taasu waa wixii aad doonayseen. Kolkaasaa
Fircoon hortiisa laga eryay iyagii. 12 Markaasaa Rabbigu
wuxuu Muuse ku yidhi, Gacantaada ayaxa ugu fidi dalka
Masar korkiisa, inuu kor yimaado dalka Masar, oo uu cuno
geed yar oo kasta, oo ah in alla intii roobkii dhagaxyada
lahaa ka baxsatay. 13 Markaasuu Muuse ushiisii dalkii
Masar ku kor fidiyey, oo Rabbigu maalintaas oo dhan iyo
habeenkii oo dhan, wuxuu dhulkii ku soo daayay dabayl

bari ka timid, oo markii waagii beryay ayaa dabayshii bari
ayaxii keentay. **14** Kolkaasaa ayaxii dalkii Masar oo idil
dul fuulay, oo wuxuu ku soo degay dalkii Masar oo dhan;
wuxuuna ahaa ayax baas; hortiisna lama arag ayax saas
oo kale ah, dabadiisna ma jiri doono kaas oo kale. **15**
Waayo, wuxuu qariyey dhulka dushiisa oo dhan, kolkaasaa
dalkii gudcur noqday; oo wuxuu cunay dhalatadii waddanka
oo dhan, iyo midhihii dhirtii roobkii dhagaxyada lahaa ka
baxsaday oo dhan; oo dalkii Masar oo dhanna wax cagaar
ahuna kuma hadhin ama dhir ha noqoto ama dhalatada
duurka. **16** Markaasaa Fircoon dhaqso ugu yeedhay Muuse
iyo Haaruun, oo wuxuu ku yidhi, Waan ku dembaabay
Rabbiga Ilaahiinna ah iyo idinkaba. **17** Haddaba waan ku
baryayaaye, iga cafi dembigayga markan keliya, oo ii barya
Rabbiga Ilaahiinna ah, inuu iga qaado dhimashadan keliya.
**18** Kolkaasuu Fircoon dibadda uga baxay oo Rabbiga baryay.
**19** Markaasaa Rabbigu wuxuu soo leexiyey dabayl aad iyo
aad u xoog badan oo galbeed ka timid, kolkaasay ayaxii kor
u qaadday oo waxay ku gurtay Badda Cas, oo xataa ayax
qudha ahi kuma hadhin dalka Masar oo dhan. **20** Markaasaa
Rabbigu sii qallafiyey Fircoon qalbigiisii, mana uusan sii
dayn reer binu Israa'iil inay tagaan. **21** Markaasaa Rabbigu
wuxuu Muuse ku yidhi, Gacantaada xagga samada u taag,
in gudcur ku soo dego dalka Masar, kaasoo ah gudcur aad
u daran. **22** Kolkaasaa Muuse gacanta xagga samada u
taagay; oo waxaa dalkii Masar ku soo degay gudcur weyn
oo in saddex maalmood ah jiray; **23** oo midkoodna midka
kale ma arkin, ama midkoodna meeshiisii kama kicin in
saddex maalmood ah; laakiinse reer binu Israa'iil oo dhan
guryahoodu iftiin bay lahaayeen. **24** Markaasaa Fircoon
Muuse u yeedhay oo wuxuu ku yidhi, Taga oo Rabbiga
u adeega; laakiinse adhyihiinna iyo lo'diinnu ha joogeen;
yaryarkiinnuse ha idin raaceen. **25** Muusena wuxuu yidhi, De
waa inaad weliba na siisaa allabaryo iyo qurbaan la gubo,
oo aannu u bixinno Rabbiga ah Ilaahayaga. **26** Lo'dayaduna
waa inay na raacdaa, oo waa inaan neef keliyahu dib nooga
hadhin, waayo, iyada waa inaannu wax ka qaadannaa si
aannu ugu adeegno Rabbiga ah Ilaahayaga. Annagu garan
mayno wax aannu ugu adeegno Rabbiga jeeraannu tagno
xaggaas. **27** Laakiinse Rabbigu waa sii qallafiyey Fircoon
qalbigiisii, mana u doonaynin inuu iyaga sii daayo. **28**
Markaasaa Fircoon wuxuu isagii ku yidhi, War iga tag, oo iska
jir, si aadan wejigayga mar dambe u arkin, waayo, maalintii
aad wejigayga aragtid hubaal waad dhiman doontaa. **29**
Markaasaa Muuse wuxuu ku yidhi, Adigu si wanaagsan
baad u hadashay, oo wejigaaga mar dambe arki maayo.

**11** Markaasaa Rabbigu wuxuu Muuse ku yidhi, Weli
belaayo kale ayaan Fircoon iyo Masar ku soo dejin
doonaa; oo dabadeedna wuu idin sii dayn doonaa inaad
halkan ka tagtaan, oo markuu idin sii daayo, giddigiin ayuu
halkan idinka sii wada eryi doonaa. **2** Haddaba dadka
dhegihiisa maqashii, oo nin waluba ha weyddiisto deriskiisa,
naag walubana ha weyddiisato deriskeeda alaab lacag ah
iyo alaab dahab ah. **3** Rabbiguna Masriyiintii ayuu dadkii
raalli uga dhigay. Oo weliba ninkii Muuse ahaa wuxuu
dalka Masar ku ahaa mid aad u weyn xagga Fircoon
addoommadiisa iyo xagga dadkaba. **4** Muusena wuxuu yidhi,
Waxaa Rabbigu leeyahay, Habeenbadhka baan dalka Masar
ku dhex soconayaa, **5** oo curadyada dalka Masar jooga
oo dhammu way wada dhiman doonaan, curadka Fircoon
oo ku fadhiya carshigiisa, ilaa la gaadho curadka gabadha
addoonta ah oo ka dambaysa dhagaxshiidka, iyo curadyada
xoolaha oo dhan. **6** Oo waxaa dalka Masar oo dhan jiri
doonta oohin weyn, taas oo kale aan hore loo arag, hadda
kaddibna aan la arki doonin marnaba. **7** Laakiinse reer binu
Israa'iil dad iyo duunyo toona xataa eeyna afka u kala qaadi
maayo, si aad u ogaataan in Rabbigu kala duway Masriyiinta
iyo reer binu Israa'iil. **8** Oo addoommadaadan oo dhammu
anigay ii iman doonaan, oo anigay ii sujuudi doonaan, iyagoo
leh, Iska bax, adiga iyo dadka kula socda oo dhammuba; oo
markaas dabadeed ayaan bixi doonaa. Oo wuxuu Fircoon
kaga tegey cadho aad u kulul. **9** Markaasaa Rabbigu wuxuu
Muuse ku yidhi, Fircoon hadalkaaga dhegaysan maayo,
inay cajaa'ibyadaydu dalka Masar ku sii bataan aawadeed.
**10** Muuse iyo Haaruunna cajaa'ibyadan oo dhan waxay ku
sameeyeen Fircoon hortiisa; Rabbiguna waa sii qallafiyey
qalbigii Fircoon oo isna ma uusan sii dayn reer binu Israa'iil
inay dalkiisa ka baxaan.

**12** Oo Rabbigu wuxuu Muuse iyo Haaruun kula hadlay
dalka Masar, oo ku yidhi, **2** Bishanu waxay idiin
noqonaysaa tii bilaha ugu horraysay; oo waxay idiin
noqonaysaa sannadda bisheedii kowaad. **3** Shirka reer
binu Israa'iil oo dhan la hadla oo waxaad ku tidhaahdaan,
Maalinta tobnaad oo bishan waa in nin waluba wan qaataa
sida reeraha aabbayaashood yihiin, qoys waluba wan ha
qaato; **4** oo haddii qoys uusan wada qaadan karin wan, de
markaas waa in isaga iyo deriskiisa oo ah kan qoyskiisa ku
xiga ay mid wada qaataan oo ay u qaybsadaan sida tirada
dadku tahay; nin walba sida cuntadiisu tahay waa inaad u
tirisaan kalaqaybinta wanka. **5** Wankiinnu waa inuu ahaadaa
mid aan iin lahayn, waana inuu ahaadaa mid lab oo sannad
jiray, waana inaad wananka ama orgiyada ka bixisaan, **6**

oo waa inaad gooni u xidhaan ilaa bisha maalinteeda afar
iyo tobnaad; oo ururka shirka reer binu Israa'iil oo dhammu
waa inay makhribkii qalaan. 7 Oo waa inay dhiigga wax ka
qaataan, oo ay mariyaan fayaaradda albaabka labadeeda
dhinac iyo meesheeda sare oo ah guryaha ay wax ku
dhex cuni doonaan. 8 Oo habeenkaas waa inay cunaan
hilibka oo dab lagu dubay, iyo kibis aan khamiir lahayn,
oo ha ku cuneen caleemo qadhaadh. 9 Ha cunina isagoo
ceedhiin ama biyo lagu kariyey, laakiin waxaad cuntaan
isagoo dab lagu dubay, oo qaba madaxiisa iyo mijihiisa iyo
waxa gudihiisa ku jira qaba. 10 Oo waa inaydnaan waxba ka
reebin ilaa subaxda, laakiin waxa ka hadha markuu waagu
beryo waa inaad dab ku gubtaan. 11 Oo sidan waa inaad u
cuntaan, idinkoo guntan, oo kabihiinnu cagaha idiinku jiraan,
ushiinnuna gacanta idiinku jirto; oo waa inaad degdeg u
cuntaan; waayo, waa Rabbiga Kormariddiisa. 12 Waayo,
habeenkaas waxaan dhex mari doonaa dalka Masar, oo
waxaan wada layn doonaa curadyada dalka Masar oo
dhan, kuwa dadka iyo kuwa duunyadaba, oo ilaahyada
Masar oo dhan waxaan ku soo dejin doonaa xukummo.
Anigu waxaan ahay Rabbiga. 13 Oo dhiiggu wuxuu idiin
noqon doonaa calaamo kor taal guryaha aad ku jirtaan; oo
markii aan dhiigga arko, waan iska kiin kor mari doonaa,
belaayo idin baabbi'isaana idinkuma dhici doonto, markaan
wax ku dhufto dhulka Masar. 14 Oo maalintanu waa inay
xusuus idiin noqotaa, oo waa inaad Rabbiga u iiddaan. Waa
inaad ka ab ka ab weligiin ku dhawrtaan iid amar ahaan.
15 Toddoba maalmood waxaad cuntaan kibis aan khamiir
lahayn; weliba maalinta kowaad waa inaad khamiirka ka
saartaan guryihiinna; waayo, ku alla kii cuna kibis khamiir
leh maalinta kowaad ilaa maalinta toddobaad, qofkaas
waa laga gooyn doonaa reer binu Israa'iil. 16 Maalinta
kowaad waxaa idiin ahaan doona shir quduus ah, maalinta
toddobaadna shir quduus ah. Wax shuqul ah maalmahaas
waa inaan la qaban, waxa qof kastaaba cuno mooyaane,
taas oo keliya baa la samayn karaa. 17 Oo idinku waa
inaad dhawrtaan iidda kibista aan khamiirka lahayn, waayo,
maalintaas qudheeda ayaan dadkiinna badnaantiisii ka soo
bixiyey dalkii Masar; sidaas daraaddeed amar ahaan waa
inaad ka ab ka ab weligiin ku dhawrtaan maalintaas. 18 Bisha
kowaad, maalinteeda afar iyo tobnaad, markay fiidkii tahay
waa inaad cuntaan kibis aan khamiir lahayn, ilaa laga gaadho
maalinta koob iyo labaatanaad oo bisha, markay fiidkii tahay.
19 Toddoba maalmood waa inaan guryihiinna khamiir laga
helin; waayo, ku alla kii wax khamiir leh cuna, qofkaas
waa laga gooyn doonaa shirka reer binu Israa'iil, hadduu
yahay qariib iyo hadduu waddanka ku dhex dhashayba.
20 Wax khamiir leh waa inaydnaan cunin; guryihiinna oo
dhan waa inaad ku cuntaan kibis aan khamiir lahayn. 21
Markaasaa Muuse wuxuu u wada yeedhay waayeelladii reer
binu Israa'iil oo dhan, oo wuxuu iyagii ku yidhi, La baxa
wanan oo qoys, qoys u qaata, oo qala wanka Kormaridda.
22 Waxaad qaadataan xidhmo geed husob ah, oo waxaad
dartaan dhiigga ku jira xeedhada, oo albaabka fayaaraddiisa
sare iyo labada dhinac oo fayaaradda ah ku taabsiiya
dhiiga ku jira xeedhada; oo midkiinna ilaa waagu ka beryo
yuusan albaabka gurigiisa dibadda uga bixin. 23 Waayo,
Rabbigu wuxuu dhex mari doonaa dalka, oo wuxuu layn
doonaa Masriyiinta, oo markuu arko dhiigga ku yaal albaabka
fayaaraddiisa sare iyo labada dhinac oo fayaaradda ah ayaa
Rabbigu kor mari doona albaabka, oo u oggolaan maayo
in baabbi'iyuhu guryihiinna soo galo oo idin laayo. 24 Oo
waxan amar ahaan waa inaad weligiin u dhawrtaan idinka iyo
carruurtiinnuba. 25 Oo markii aad timaadaan dalka Rabbigu
idin siin doono, oo uu idiinku ballanqaaday, waa inaad
dhawrtaan u adeegiddan Ilaah. 26 Oo markii carruurtiinnu
idinku yidhaahdaan, Maxaad ula jeeddaan u-adeegiddan
Ilaah? 27 waxaad ku odhan doontaan, Waa allabarigii
Rabbiga Kormariddiisii, kii kor maray guryihii reer binu Israa'iil
markay Masar joogeen, oo samatabbixiyey reerahayagii,
Masriyiintiise laayay. Markaasaa dadku madaxa u foororiyey
oo u sujuuday. 28 Markaasaa reer binu Israa'iil tageen oo
sidaas yeeleen; sidii Rabbigu Muuse iyo Haaruun ku amray
ayay yeeleen. 29 Oo waxaa dhacday in habeenbadhkii
Rabbigu laayay curadyadii dalkii Masar oo dhan, inta laga
bilaabay curadkii Fircoon oo carshigiisii ku fadhiyey ilaa
la gaadhay curadkii maxbuuska godxabsiga ku jiray, iyo
curadyadii xoolaha oo dhan. 30 Markaasaa habeenkaas
waxaa kacay Fircoon, iyo addoommadiisii oo dhan, iyo
Masriyiintii oo dhan; oo oohin aad u weyn baa Masar
ka dhacday, waayo, ma jirin guri aan meyd oollin. 31
Markaasuu Muuse iyo Haaruun u yeedhay habeennimadii,
oo wuxuu ku yidhi, Kaca, oo dadkayga ka dhex baxa,
idinka iyo reer binu Israa'iilba; taga oo Rabbiga u adeega,
sidaad u tidhaahdeen. 32 Oo adhyihiinna iyo lo'diinnaba
kaxaysta, sidaad u tidhaahdeen, iina soo duceeya. 33 Oo
Masriyiintuna waxay dadka ku deddejiyeen inay dhaqso
uga saaraan dalka; waayo, waxay yidhaahdeen, Kulligeen
waxaynu nahay dad go'ay. 34 Markaasaa dadkii waxay
qaateen cajiinkoodii intaanu khamiirin, iyo weelashoodii ay
wax ku dhex cajiimi jireen, oo intay maryahoodii ku xidheen
ayay garbaha saarteen. 35 Oo reer binu Israa'iilna waxay
yeeleen sidii Muuse eraygiisu ahaa; oo waxay Masriyiintii
weyddiisteen alaab lacag ah iyo alaab dahab ah iyo dhar;

36 oo Rabbiguna Masriyiintii ayuu dadkii raalli uga dhigay,
oo sidaas daraaddeed way u daayeen inay qaataan wixii
ay weyddiisteenba. Oo iyana Masriyiintii way dheceen. 37
Oo reer binu Israa'iilna waxay ka sodcaaleen Racmeses oo
waxay tageen Sukod, tiradooduna waxay ku dhowayd lix
boqol oo kun oo nin oo lugaynaya oo aan carruurta lagu tirin.
38 Oo waxaa kaloo raacay dad faro badan oo isku darsan,
iyo adhyihii, iyo lo'dii, oo ahaa xoolo aad u badan. 39 Oo
cajiinkii ay Masar kala yimaadeen ayay ka dubteen kibis
aan khamiir lahayn, waayo, ma ay khamiirin; maxaa yeelay,
dalkii Masar degdeg bay kaga soo bexeen, oo ma aanay sii
joogi karin, mana ay diyaarsan sahay. 40 Reer binu Israa'iil
intay dalka Masar qariib ku ahaayeen waxay ahayd afar
boqol iyo soddon sannadood. 41 Oo markii afartii boqol iyo
soddonkii sannadood dhammaadeen, isla maalintaas ayaa
Rabbiga dadkiisii badnaa oo dhammu ka baxay dalkii Masar.
42 Habeenkaasu waa habeen aad Rabbiga loogu dhawro,
bixintii uu iyaga Masar ka soo bixiyey aawadeed; kaasu
waa habeenkii Rabbiga oo ay reer binu Israa'iil oo dhammu
ka ab ka ab aad u dhawraan. 43 Markaasaa Rabbigu
wuxuu Muuse iyo Haaruun ku yidhi, Kanu waa amarkii
iidda Kormaridda; shisheeyuhuna yuusan wax ka cunin;
44 laakiinse nin kasta addoonkiisa uu lacagta ku iibsaday,
markaad guddo dabadeed waa inuu wax ka cunaa. 45 Kii
qariib ah iyo midiidinka la soo kiraystay toona midkoodna
waa inuusan wax ka cunin. 46 Oo waa in isku guri lagu
cuno; oo waa inaadan hilibka waxba dibadda uga bixin;
lafna waa inaydnaan ka jebin. 47 Oo shirka reer binu Israa'iil
oo dhammu waa inuu dhawro. 48 Oo haddii mid qariib
ahu idinla dego, oo uu doonayo inuu Rabbiga u dhawro
iidda Kormaridda, de waa in intiisa lab oo dhan la wada
gudaa, oo markaas ha soo dhowaado oo ha dhawro, oo
markaas wuxuu noqon doonaa sidii mid dalka ku dhashay;
laakiinse qof buuryoqab ahu waa inuusan wax ka cunin. 49
Kan waddanka ku dhashay iyo kan qariibka ah oo idin dhex
degganu waa inay isku sharci ahaadaan. 50 Sidaasay reer
binu Israa'iil oo dhammu yeeleen; sidii Rabbigu Muuse iyo
Haaruun ku amray ayay yeeleen. 51 Oo isla maalintaasaa
Rabbigu reer binu Israa'iil uga bixiyey dalkii Masar, siday
guutooyinkoodii ahaayeen.

**13** Markaasaa Rabbigu Muuse la hadlay oo wuxuu ku
yidhi, 2 Curadyada oo dhan quduus iiga dhig; wax alla
wixii maxal fura oo ku dhex jira reer binu Israa'iil, dad iyo
duunyoba, anigaa iska leh. 3 Markaasaa Muuse wuxuu dadkii
ku yidhi, Xusuusta maalintan aad Masar ka soo baxdeen, oo
aad ka soo baxdeen gurigii addoonsiga; waayo, Rabbigu
gacan xoog badan buu idinkaga soo bixiyey meeshan; waa
inaan kibis khamiirsan la cunin. 4 Idinku waxaad baxdeen
maanta oo ah bisha Aabiib. 5 Oo markii Rabbigu idin
geeyo dalka reer Kancaan iyo reer Xeed, iyo reer Amor,
iyo reer Xiwi, iyo reer Yebuus, oo uu awowayaashiin ugu
dhaartay inuu idin siinayo, kaas oo ah dal caano iyo malab
la barwaaqaysan, de markaas waa inaad bishan dhexdeeda
dhawrtaan u adeegiddan Ilaah. 6 Toddoba maalmood
waa inaad kibis aan khamiir lahayn cuntaan, oo maalinta
toddobaad waa inay iid Rabbiga u ahaato. 7 Oo kibis aan
khamiir lahayn waa in la cunaa toddobada maalmood oo
dhan; oo waa inaan lagugu arag kibis khamiirsan, ama waa
inaan xataa lagugu arag khamiir, tan iyo xudduudkaaga
oo dhan. 8 Maalintaas waa inaad wiilkaaga u sheegtaa,
oo waxaad ku tidhaahdaa, Waa wixii Rabbigu ii sameeyey
aawadood markii aan Masar ka soo baxay. 9 Oo waxay kuu
noqon doontaa calaamo gacantaada saaran, iyo xusuus
indhahaaga u dhaxaysa, in Rabbiga sharcigiisu afkaaga ku
jiro; waayo, Rabbigu gacan xoog leh buu kaaga soo bixiyey
dalkii Masar. 10 Sidaas daraaddeed waa inaad amarkan
haysaa xilligiisa, oo aad dhawrtaa sannad ilaa sannad. 11
Oo markii Rabbigu ku geeyo dalka reer Kancaan siduu ugu
dhaartay adiga iyo awowayaashaaba, oo uu ku siiyo, 12 de
markaas waa inaad Rabbiga gooni ugu soocdaa kulli intii
maxal furta oo dhan iyo intii xoolaha curad ah, mid kasta
oo lab ah Rabbigu waa iska lahaan doonaa. 13 Oo curad
kasta oo dameer ah waa inaad ku madax furtaa wan yar; oo
haddii aadan doonaynin inaad madax furto, de markaas waa
inaad luqunta ka jebisaa, oo dadkaaga curadyadiisa oo dhan
waa inaad wax ku madax furtaa. 14 Oo dabadeedto markii
wiilkaagu wax ku weyddiiyo oo kugu yidhaahdo, Waxanu
waa maxay? waa inaad ku tidhaahdaa isaga, Gacan xoog
badan baa Rabbigu nagaga soo bixiyey Masar oo ahaa
gurigii addoonsiga; 15 oo markii Fircoon dooni waayay
inuu na sii daayo, waxaa dhacday inuu Rabbigu wada
laayay curadyadii Masar oo dhan oo ahaa curadyadii dadka
iyo curadyadii duunyadaba; oo sidaas daraaddeed baan
Rabbiga allabari ugu bixiyaa wax alla wixii maxal fura oo
dhan, ee ah inta lab, laakiinse dadkayga curadyadiisa oo
dhan wax baan ku madax furtaa. 16 Oo waxay kuu noqon
doontaa calaamo gacantaada saaran, iyo wax ka laalaada
indhahaaga dhexdooda; waayo, Rabbigu gacan xoog badan
buu Masar nagaga soo bixiyey. 17 Oo markii Fircoon dadkii
sii daayay, Ilaah kuma uu kaxayn jidka dalka reer Falastiin in
kastoo uu kaasu dhowaa, waayo, Ilaah wuxuu yidhi, Waaba
intaasoo dadku markay dagaal arkaan ay qoomameeyaan,
oo ay Masar dib ugu noqdaan. 18 Laakiinse Ilaah wuxuu

dadkii u hor kacay waddada la wareegta cidlada ku ag taal
Badda Cas; reer binu Israa'iilna waxay Masar ka bexeen
iyagoo hubkoodii sita. 19 Markaasaa Muuse wuxuu qaaday
lafihii Yuusuf; waayo, Yuusuf aad buu ugu dhaartay reer
binu Israa'iil, oo wuxuu ku yidhi, Hubaal Ilaah waa idin
soo booqan doonaa; ee lafahayga waa inaad halkan ka
qaaddaan. 20 Oo waxay sodcaalkoodii ka bilaabeen Sukod,
oo waxay degeen Eetaam, oo ku taal cidlada qarkeeda. 21
Rabbiguna inuu iyaga jidka tuso aawadeed ayuu maalintii
hortooda socon jiray isagoo ku jira tiir daruur ah, habeenkiina
tiir dab ah, inuu iyaga u iftiimiyo si ay u socdaan hadh iyo
habeenba. 22 Tiirkii daruurta ahaa oo maalinta, iyo tiirkii
dabka ahaa oo habeenka kama tegin dadka hortiisa.

14 Markaasaa Rabbigu la hadlay Muuse, oo wuxuu ku
yidhi, 2 La hadal reer binu Israa'iil oo u sheeg inay dib
u soo noqdaan oo ay degaan meel ka horraysa Fiihaahiirod,
oo u dhaxaysa Migdol iyo badda, kana horraysa Bacal
Sefoon. Horteeda oo meel badda agteeda ah waa inaad
degtaan. 3 Oo Fircoon wuxuu wax ka sheegi doonaa reer
binu Israa'iil, oo odhan doonaa, Dhulkaa murgiyey, oo
cidladaa xidhay iyagii. 4 Oo anna waxaan qallafin doonaa
Fircoon qalbigiisa, oo isna wuu soo raacdaysan doonaa
iyaga; markaasaan Fircoon iyo ciidankiisaba ciso ka heli
doonaa; Masriyiintuna waxay ogaan doonaan inaan anigu
ahay Rabbiga. Oo iyana sidii bay yeeleen. 5 Oo waxaa loo
sheegay boqorkii Masar inay dadkii carareen; markaasaa
Fircoon iyo addoommadiisii qalbigoodii wuxuu u rogmaday
xaggii dadka, oo waxay yidhaahdeen, Waxan aynu samaynay
waa maxay, oo maxaynu reer binu Israa'iil uga sii daynay
adeegiddii ay inoo adeegi jireen? 6 Markaasuu wuxuu
diyaarsaday gaadhifaraskiisii, oo wuxuu watay dadkiisii;
7 Oo wuxuu kaxaystay lix boqol oo gaadhifaras ah oo la
doortay, iyo gaadhifardoodkii Masar oo dhan, iyo saraakiil
u sarraysa kulligood. 8 Markaasaa Rabbigu qallafiyey
qalbigii boqorkii Masar oo Fircoon ahaa; kolkaasuu wuxuu
raacdaystay reer binu Israa'iil; waayo, reer binu Israa'iil waxay
ku bexeen gacan sarraysa. 9 Markaasaa Masriyiintii iyagii
raacdaysteen. Kulli Fircoon fardihiisii iyo gaadhifardoodkiisii
oo dhan, iyo fardooleydiisii, iyo ciidankiisii ayaa raacdeeyey,
oo waxay gaadheen iyagoo deggan meel badda u dhow, oo
Fiihaahiirod dhinaceeda ah, kana horraysa Bacal Sefoon. 10
Oo markii Fircoon soo dhowaaday, ayaa reer binu Israa'iil
indhaha kor u taageen, oo waxay arkeen Masriyiintii oo
soo daba socota; markaasay aad iyo aad u cabsadeen,
oo reer binu Israa'iil ayaa Rabbiga u qayshaday. 11 Oo
waxay Muuse ku yidhaahdeen, War ma xabaalaan jirin
Masar, oo sidaa aawadeed aad noogu soo kaxaysay cidlada
inaannu ku dhimanno? Maxaad sidan noogu gashay oo aad
Masar nooga soo saartay? 12 Sow erayganu ma aha kii
aannu kugula hadalnay Masar dhexdeeda, annagoo ku leh,
Iska kaaya daa, aannu Masriyiinta u addeegnee? Waayo,
waxaa noo wanaagsanaan lahayd inaannu Masriyiinta u
adeegno, intii aannu cidlada ku dhiman lahayn. 13 Markaasaa
Muuse wuxuu dadkii ku yidhi, War ha cabsanina, oo iska
taagnaada, oo bal arka badbaadada uu Rabbigu maanta idiin
samayn doono; waayo, Masriyiinta aad maanta aragteen,
weligiin mar dambe ma arki doontaan. 14 Oo Rabbigu
aawadiin buu u diriri doonaa, oo idinku waa inaad iska
aamusnaataan. 15 Markaasaa Rabbigu wuxuu Muuse ku
yidhi, War maxaad iigu qaylinaysaa? Reer binu Israa'iil
u sheeg inay hore u socdaan. 16 Oo adigu ushaada kor
u qaad, oo gacanta badda ku kor fidi, oo kala goo; oo
reer binu Israa'iil waxay mari doonaan badda dhexdeeda
oo ay ku socon doonaan dhul engegan. 17 Oo bal ogow,
anigu waxaan qallafin doonaa qalbiga Masriyiinta, oo iyagay
daba geli doonaan; oo markaasaan ciso ka heli doonaa
Fircoon, iyo ciidankiisa oo dhan, iyo gaadhifardoodkiisa,
iyo fardooleydiisa. 18 Oo Masriyiintu markaasay garan
doonaan inaan anigu Rabbiga ahay, kolkii aan sharaf ka
helo Fircoon, iyo gaadhifardoodkiisa, iyo fardooleydiisa.
19 Markaasaa malaa'igtii Ilaah oo hor socotay reer binu
Israa'iil soo wareegtay oo daba martay iyagii, markaasaa
tiirkii daruurta ahaa ka soo hor wareegay oo uu daba maray
iyagii; 20 oo wuxuu kala dhex galay reer Masar iyo reer binu
Israa'iil; oo waxaa jiray daruur iyo gudcur, laakiinse weliba
habeennimadii wuu iftiimay; oo habeenkii oo dhan midna
uma soo dhowaan ka kale. 21 Markaasaa Muuse gacantii
baddii ku kor fidiyey, oo habeenkii oo dhan Rabbigu wuxuu
baddii dib ugu celiyey dabayl xoog badan oo bari ka timid, oo
wuxuu baddii ka dhigay dhul engegan, oo biyihiina way kala
go'een. 22 Markaasaa reer binu Israa'iil baddii dhex mareen,
oo waxay ku socdeen dhul engegan, oo biyihiina waxay
iyagii u ahaayeen derbi xagga midigta iyo xagga bidixdaba.
23 Markaasaa Masriyiintiina soo eryadeen, oo intay soo
daba galeen ayay waxay mareen badda dhexdeeda, oo
waxayna ahaayeen Fircoon fardihiisii iyo gaadhifardoodkiisii,
iyo fardooleydiisii oo dhan. 24 Oo markii waagii beryay
waxaa dhacday in Rabbigu ciidankii Masriyiinta ka dhex
fiiriyey tiirkii dabka ahaa iyo kii daruurta ahaa, kolkaasuu
kadeeday ciidankii Masriyiinta. 25 Kolkaasuu giringirihii
gaadhifardoodkooda xidhay, inay si dhib leh u kexeeyaan;
markaasay Masriyiintii waxay yidhaahdeen, Reer binu Israa'iil
hortooda aynu ka cararno; waayo, Rabbigu waa u dirirayaa

iyaga oo uga hiilinayaa Masriyiinta. 26 Markaasaa Rabbigu
wuxuu Muuse ku yidhi, Badda gacanta ku kor fidi, inay
biyuhu ku soo noqdaan Masriyiinta, iyo gaadhifardoodkooda,
iyo fardooleydooda. 27 Markaasaa Muuse gacantii badda ku
kor fidiyey, oo markii waagii beryay ayaa baddii xooggeedii
hore ku soo noqotay, markaasaa Masriyiintiina ka carareen;
kolkaasaa Rabbigu wuxuu Masriyiintii ku tuuray badda
dhexdeedii. 28 Markaasaa biyihii isku soo noqdeen, oo waxay
qariyeen gaadhifardoodkii, iyo fardooleydii, iyo xataa ciidankii
Fircoon oo dhan oo badda dhexdeeda reer binu Israa'iil ku
eryaday, oo xataa midna kama hadhin. 29 Laakiinse reer
binu Israa'iil waxay ku socdeen dhul engegan oo badda
dhexdeeda ah, biyihiina waxay iyagii u ahaayeen derbi
xagga midigta iyo xagga bidixdaba. 30 Oo sidaasaa Rabbigu
reer binu Israa'iil uga badbaadiyey gacantii Masriyiinta; oo
reer binu Israa'iilna waxay arkeen Masriyiintii oo dhimatay
oo badda xeebteeda taal. 31 Markaasaa reer binu Israa'iil
waxay arkeen shuqulkii weynaa oo Rabbigu ku sameeyey
Masriyiintii, kolkaasay dadkii Rabbiga ka cabsadeen, oo
waxay rumaysteen Rabbiga iyo addoonkiisii Muuse.

**15** Markaasaa Muuse iyo reer binu Israa'iil waxay Rabbiga
ugu gabyeen gabaygan, oo intay qaadeen, bay
yidhaahdeen, Anigu Rabbiga waan u gabyi doonaa, waayo,
ammaan buu ku guulaystay; Faraskii iyo kii fuushanaaba
wuxuu ku tuuray badda. 2 Rabbigu waa xooggayga iyo
gabaygayga, Oo isagu wuxuu noqday badbaadadayda.
Kanu waa Ilaahay, oo anigu waan ammaani doonaa isaga;
Waa Ilaahii aabbahay, aniguna waan sarraysiin doonaa.
3 Rabbigu waa dagaalyahan, Magiciisuna waa Rabbi. 4
Wuxuu Fircoon gaadhifardoodkiisii iyo ciidankiisiiba ku tuuray
badda dhexdeeda, Oo saraakiishiisii la doortayna waxay
tiimbadeen Badda Cas dhexdeeda. 5 Oo waxaa iyagii
qariyey moolkii, Oo moolkay dhex tiimbadeen sidii dhagax
oo kale. 6 Rabbiyow, gacantaada midig xoog bay ammaan
ku leedahay, Rabbiyow, gacantaada midig cadowga bay
burburisaa. 7 Oo mudnaantaada weynaanteeda ayaad
ku jebisaa kuwa adiga kugu kaca. Oo waxaad soo dirtaa
cadhadaada, kolkaasay iyaga u gubtaa sidii jirrido yaryar oo
jajab ah. 8 Oo neeftii sankaaga aawadeed ayaa biyihii isdul
rasaysmeen, Daadkiina kor buu u kacay sidii taallo; Moolkiina
wuxuu ku adkaaday badda dhexdeeda. 9 Oo cadowgii
wuxuu yidhi, Anigu waan eryan doonaa, anigu waan gaadhi
doonaa, boolida waan kala qaybin doonaa. Oo damacaygu
waa ka dhergi doonaa iyaga; Oo seeftaydaan galka kala
bixi doonaa, gacantayduna way baabbi'in doontaa iyaga. 10
Adigu dabayshaadii baad ku afuuftay, oo baddii baa qarisay
iyagii; Oo sidii laxaamad oo kale ayay u dhex tiimbadeen
biyihii xoogga badnaa. 11 Rabbiyow, adiga bal yaa kula
mid ah ilaahyada dhexdooda? Bal yaa adiga kula mid ah
oo quduusnimada ammaan ku leh, Oo ammaantiisa laga
cabsadaa, oo cajaa'ibyo sameeya? 12 Adigu gacantaadii
midig baad soo fidisay, Markaasaa dhulku liqay iyagii. 13 Oo
raxmaddaadaad ku soo hor kacday dadkii aad soo madax
furatay. Oo waxaad iyagii ku soo hor kacday xooggaaga,
waxaadna u soo wadday rugtaada quduuska ah. 14 Oo
dadyowgii baa maqlay, wayna gariireen. Kuwii Falastiin
degganaana waxay noqdeen sidii dumar fool qabatay. 15
Markaasay ugaasyadii reer Edom yaabeen; Raggii xoogga
weynaa oo Moo'aabna gariir baa qabtay. Dadkii Kancaan
degganaa oo dhammuna way dhalaaleen. 16 Oo cabsi iyo
naxdin baa ku dhacay iyagii. Oo gacantaada weynaanteeda
aawadeed ayay sidii dhagax oo kale u aamuseen, Ilaa ay
dadkaagu gudbeen, Rabbiyow, Ilaa ay dadkii aad soo iibsatay
gudbeen. 17 Iyaga gudahaad soo gelin doontaa, oo waxaad
ku beeri doontaa buurta dhaxalkaaga, Taasoo ah meesha aad
u samaysatay inaad degganaatid, Rabbiyow, Waana meesha
quduuska ah oo gacmahaagu diyaariyeen. 18 Rabbigu boqor
buu ahaan doonaa weligiis iyo weligiisba. 19 Waayo, Fircoon
fardihiisii waxay baddii la galeen gaadhifardoodkiisii, iyo
fardooleydiisii, oo Rabbigu biyihii badda ayuu dushooda ku
soo celiyey; laakiinse reer binu Israa'iil waxay ku socdeen
dhul engegan oo badda dhexdeeda ah. 20 Markaasaa
Maryan oo nebiyad ahayd, Haaruunna walaashiis ahayd,
ayaa waxay gacanteeda ku qaadatay daf; kolkaasaa dumarkii
oo dhammu ka daba yaaceen iyagoo cayaaraya oo dafaf
wata. 21 Markaasaa Maryan waxay ugu celisay iyagii, War
Rabbiga u gabya, waayo, ammaan buu ku guulaystay; Oo
faraskii iyo kii fuushanaaba wuxuu ku tuuray badda. 22
Markaasaa Muuse reer binu Israa'iil hore uga sii kexeeyey
Badda Cas, oo waxay tageen cidlada Shuur la yidhaahdo;
oo waxay cidlada ku dhex soconayeen saddex maalmood,
oo biyona ma ay helin. 23 Oo markii ay yimaadeen
Maaraah, way cabbi kari waayeen biyihii Maaraah, waayo,
way qadhaadhaayeen, oo sidaas daraaddeed magaceedii
waxaa loo bixiyey Maaraah. 24 Markaasay dadkii Muuse u
gunuuseen, oo waxay yidhaahdeen, Bal maxaannu cabnaa?
25 Kolkaasuu Rabbiga u qayshaday, oo Rabbigu wuxuu
tusay geed, geedkiina wuu ku dhex tuuray biyihii, markaasaa
biyihii macaan noqdeen. Oo meeshaas buu wuxuu ugu
sameeyey qaynuun iyo amar, oo meeshaas buu ku tijaabiyey
iyagii; 26 oo wuxuu ku yidhi, Haddaad aad u dhegaysatid
Rabbiga Ilaahaaga ah codkiisa, oo aad samaysid wixii ku
hagaagsan indhihiisa hortooda, oo aad dhegta u dhigtid

amarradiisa, oo aad dhawrtid qaynuunnadiisii oo dhan, de markaas anigu kugu ridi maayo cudurradii aan Masriyiinta ku riday midnaba; waayo, anigu waxaan ahay Rabbiga ku bogsiiya. **27** Markaasay waxay yimaadeen meel la yidhaahdo Eelim, oo meeshaas waxaa ku yiil laba iyo toban ilood oo biyo ah, iyo toddobaatan geed oo timir ah, oo halkaasay degeen biyaha agtooda.

**16** Markaasay ka ambabbexeen Eelim, oo shirkii reer binu Israa'iil oo dhammu waxay yimaadeen cidlada Siin la yidhaahdo, taasoo u dhaxaysa Eelim iyo Siinay, waxayna ahayd bishii labaad, maalinteedii shan iyo tobnaad, taasoo ka dambaysay baxniintii ay Masar ka soo bexeen.
**2** Markaasaa shirkii reer binu Israa'iil oo dhammu cidladii Muuse iyo Haaruun ugu gunuuseen. **3** Oo reer binu Israa'iilna waxay iyagii ku yidhaahdeen, Waxaa noo wanaagsanaan lahayd inaannu gacanta Rabbiga ku dhimanno, annagoo dalkii Masar joogna, intii aannu ag fadhinnay dheryaha hilibka ah, oo aannu kibis ka dhergaynay, waayo, waxaad cidladan noogu soo bixiseen inaad ururkan oo dhan gaajo ku dishaan. **4** Markaasaa Rabbigu wuxuu Muuse ku yidhi, Bal eeg, waxaan samada idiinka soo dayn doonaa kibis, oo dadku waa inay dibadda u baxaan oo maalin walba soo urursadaan in maalin ku filan, si aan u tijaabiyo iyaga, bal inay sharcigayga ku socdaan iyo in kale. **5** Oo maalinta lixaad waa inay diyaarsadaan wixii ay soo gurteen, kolkaasay noqon doontaa intii ay maalin walba guran jireen in labanlaabkeed ah. **6** Markaasaa Muuse iyo Haaruun waxay reer binu Israa'iil oo dhan ku yidhaahdeen, Makhribka baad ogaan doontaan inuu Rabbigu idinka soo bixiyey dalkii Masar, **7** oo subaxdana waxaad arki doontaan ammaantii Rabbiga, waayo, wuu maqlayaa gunuuskiinna aad Rabbiga u gunuusaysaan. Oo annagu maxaannu nahay oo aad noogu gunuusaysaan? **8** Markaasaa Muuse wuxuu yidhi; Rabbigu makhribka wuxuu idin siin doonaa hilib aad cuntaan, subaxdana wuxuu idin siin doonaa kibis aad ka dheregtaan; maxaa yeelay, Rabbigu wuxuu maqlayaa gunuuskiinna aad isaga u gunuusaysaan. Bal maxaannu annagu nahay? Annaga noo gunuusi maysaane, ee waxaad u gunuusaysaan Rabbiga. **9** Markaasaa Muuse wuxuu Haaruun ku yidhi, Shirka reer binu Israa'iil oo dhan waxaad ku tidhaahdaa, Rabbiga hortiisa ku soo dhowaada; waayo, wuu maqlay gunuuskiinnii. **10** Intii Haaruun la hadlayay shirkii reer binu Israa'iil oo dhan waxay eegeen xaggii cidlada, oo bal eeg, ammaantii Rabbiga ayaa daruurtii ka dhex muuqatay. **11** Markaasaa Rabbigu Muuse la hadlay, oo wuxuu isagii ku yidhi, **12** Anigu waan maqlay gunuuskii reer binu Israa'iil; haddaba la hadal, oo waxaad ku tidhaahdaa, Makhribka waxaad cuni doontaan hilib, subaxdana waxaad ka dhergi doontaan kibis; oo waad ogaan doontaan inaan anigu ahay Rabbiga Ilaahiinna ah. **13** Oo waxaa dhacday in makhribkii digaagduur yimaadeen oo ay xeradii oo dhan qariyeen, oo subaxdiina waxaa degmadii hareeraheeda ku soo degay sayax. **14** Oo markii sayaxii soo degay baabba'ay ayaa waxaa dhulkii cidlada ku hadhay wax yaryar oo goobaaban oo laale'eg sayax barafoobay. **15** Oo markay reer binu Israa'iil arkeen ayaa midkoodba ka kale ku yidhi, Maxay tahay? Waayo, ma ay garanayn waxay tahay. Kolkaasaa Muuse wuxuu iyagii ku yidhi, Tanu waa kibistii Rabbigu idiin siiyey inaad cuntaan. **16** Waxanu waa wixii Rabbigu idinku amray, Nin waluba ha ka gurto in cuntadiisa ugu filan, inta dadkiinna tiradiisu tahay, qofkiiba comer muggiis ha qaato, oo nin waluba inta teendhadiisa joogta ha u qayb qaado. **17** Oo reer binu Israa'iil sidaasay yeeleen, oo qaarna wax badan buu soo gurtay, qaarna wax yar. **18** Oo markay comerkii ku qiyaaseen, kii wax badan soo gurtay waxba kama hadhin, kii wax yar soo gurtayna waxba kama dhinmin, oo nin waluba in cuntadiisa ugu filan buu soo gurtay. **19** Markaasaa Muuse wuxuu iyagii ku yidhi, Ninna yuusan wax ka reebin ilaa subaxda. **20** Habase yeeshee Muuse ma ay dhegaysan, laakiinse qaarkood baa wax ka reebay ilaa subaxdii, kolkaasaa dirxi galay, oo ay urtay. Markaasaa Muusena iyagii u cadhooday. **21** Oo subax kasta nin waluba wuxuu guran jiray in cuntadiisa ugu filan; oo markii qorraxdu soo kululaatana, way dhalaali jirtay. **22** Oo maalintii lixaad waxay soo gurteen kibistii hore labanlaabkeed, qof waluba wuxuu soo gurtay laba comer, markaasaa taliyayaashii shirka oo dhammu intay u yimaadeen Muuse u sheegeen.
**23** Kolkaasuu wuxuu iyagii ku yidhi, Waxanu waa wixii Rabbigu ku hadlay, Berri waa maalin weyn oo nasasho ah, oo waa sabti quduus u ah Rabbiga. Wixii aad duban lahaydeen dubta, oo wixii aad karin lahaydeen kariya, oo wax alla wixii idiin hadha meel dhigta oo ha idiin yaalleen ilaa subaxda. **24** Kolkaasay meel dhigteen ilaa subaxdii, sidii Muuse ku amray; oo mana ay urin, dirxina laguma arag. **25** Markaasaa Muuse wuxuu yidhi, Intan maanta cuna; waayo, maanta waa maalin sabti u ah Rabbiga; oo maanta waxba duurka ka heli maysaan. **26** Lix maalmood waa inaad soo gurataan, laakiinse maalinta toddobaad waa sabtida, oo maalintaas waxba ma jiri doonaan innaba. **27** Oo waxaa dhacday maalintii toddobaad inay dadkii qaarkood dibadda u bexeen inay wax soo gurtaan, laakiinse waxba ma ay helin. **28** Markaasaa Rabbigu wuxuu Muuse ku yidhi, Ilaa goormaad diidaysaan inaad dhawrtaan amarradayda iyo

qaynuunnadayda? 29 Bal eega, Rabbigu wuxuu idin siiyey
sabtida, oo sidaas daraaddeed buu isagu maalintii lixaad idiin
siiyey kibis laba maalmood idinku filan; haddaba nin kasta oo
idinka mid ahu meeshiisa ha joogo, oo maalinta toddobaad
ninna yuusan meeshiisa ka bixin. 30 Oo sidaas daraaddeed
baa dadkii maalintii toddobaad u nasteen. 31 Oo reer binu
Israa'iil waxay magaceedii u bixiyeen Maanna; oo waxay u
caddayd sida midhaha koryander la yidhaahdo, waxayna
u dhadhan ekayd sidii buskud malab lagu sameeyey. 32
Markaasaa Muuse wuxuu yidhi, Waxanu waa wixii Rabbigu
idinku amray, oo wuxuu yidhi, Comer muggiis ha loo dhigo
farcankiinna dambe, inay arkaan kibistii aan idinku masruufi
jiray markaad cidlada joogteen oo aan dalkii Masar idinka
soo bixiyey. 33 Markaasaa Muuse wuxuu Haaruun ku yidhi,
Weel qaado oo waxaad ku shubtaa comer muggiis oo
Maanna ah, oo Rabbiga hor dhig in loo hayo farcankiinna
dambe. 34 Sidii Rabbigu Muuse ku amray ayaa Haaruun
Maragga hortiis u dhigay, in loo hayo aawadeed. 35 Oo reer
binu Israa'iil waxay maannadii cunayeen afartan sannadood,
ilaa ay yimaadeen dhul la deggan yahay. Waxay cuni jireen
maannadii ilaa ay yimaadeen dalkii reer Kancaan xadkiisii.
36 Comer waa eefaah toban meelood loo dhigay meeshiis.

**17** Oo markaasaa shirkii reer binu Israa'iil oo dhammu
waxay ka sodcaaleen cidlada Siin la yidhaahdo, oo
waxay u socdeen sidii Rabbigu ku amray, kolkaasay waxay
degeen meel la yidhaahdo Refiidiim; oo dadkuna ma ay
haysan biyo ay cabbaan. 2 Sidaas daraaddeed dadkii waxay
la dirireen Muuse, oo waxay ku yidhaahdeen, War biyo
aannu cabno na sii. Kolkaasaa Muuse wuxuu iyagii ku yidhi,
Bal maxaad aniga iila diriraysaan? Oo maxaad Rabbiga
u jirrabaysaan? 3 Markaasay dadkii meeshaas biyo ugu
harraadeen; kolkaasaa dadkii intay Muuse u gunuuseen
ayay waxay ku yidhaahdeen, War maxaad Masar nooga
soo kaxaysay? Ma inaad annaga iyo carruurtayada, iyo
xoolahayaga harraad noogu disha baa? 4 Kolkaasaa Muuse
Rabbiga u qayshaday oo ku yidhi, Bal maxaan dadkan ku
sameeyaa? Waayo, waxay ku dhow yihiin inay i dhagxiyaan.
5 Markaasaa Rabbigu wuxuu Muuse ku yidhi, Bal dadka
ka hor mar, oo waxaad kaxaysataa waayeellada reer binu
Israa'iil, ushaadii aad webiga ku dhufatayna gacanta ku
qabso oo tag. 6 Oo bal ogow, halkaas ayaan hortaada isku
dul taagi doonaa dhagaxa weyn oo Xoreeb yaal, kolkaas
waa inaad dhagaxa ushaada ku dhufataa, oo waxaa halkaas
ka iman doona biyo ay dadku cabbaan. Kolkaasaa Muuse
sidaas ku sameeyey waayeelladii reer binu Israa'iil hortooda.
7 Markaasuu meeshaas magaceedii wuxuu u bixiyey Masaah
iyo Meriibaah, dirirtii ay reer binu Israa'iil dirireen aawadeed,
iyo jirrabaaddii ay Rabbiga jirrabeen aawadeed, oo ay
yidhaahdeen, War, Rabbigu ma na dhex joogaa mise nama
dhex joogo? 8 Markaasaa waxaa yimid reer Camaaleq, oo
wuxuu reer binu Israa'iil kula diriray Refiidiim. 9 Markaasaa
Muuse wuxuu Yashuuca ku yidhi, Rag inoo dooro, oo la bax,
oo reer Camaaleq la dirir. Berrito waxaan istaagi doonaa
buurta dusheeda, anigoo gacanta ku haysta ushii Ilaah. 10
Kolkaasaa Yashuuca yeelay sidii Muuse ku yidhi, oo wuxuu
la diriray reer Camaaleq. Markaasaa Muuse iyo Haaruun iyo
Xuur waxay koreen ilaa buurta dusheedii. 11 Oo markii Muuse
gacanta kor u taagayba, waxaa adkaaday reer binu Israa'iil;
markuu gacanta dejiyeyna, waxaa adkaaday reer Camaaleq.
12 Laakiinse Muuse gacmihiisu way cuslaayeen; kolkaasay
waxay soo qaadeen dhagax, oo Muuse u saldhigeen, isna
kolkaasuu ku fadhiistay; Haaruun iyo Xuurna gacmihiisii
bay sare u hayeen, intuu midba dhinac ka maray, oo
gacmihiisiina way xoogeeyeen ilaa ay qorraxdii dhacday. 13
Oo Yashuucana seef afkeed buu ku jebiyey reer Camaaleq
iyo dadkiisiiba. 14 Markaasaa Rabbigu wuxuu Muuse ku
yidhi, Waxan buug ku qor si loo xusuusto, oo Yashuuca
dhegihiisa maqashii, waayo, xusuusta reer Camaaleq lagu
xusuusan jiray ayaan inta samada ka hoosaysa oo dhan ka
baabbi'inayaa. 15 Markaasaa Muuse wuxuu dhisay meel
allabari, oo magaceedii wuxuu u bixiyey Yehowah Nisii, 16
oo wuxuu yidhi, Rabbigu waa dhaartay, oo Rabbigu wuu la
dagaallami doonaa reer Camaaleq ka ab ka ab.

**18** Haddaba wadaadkii Midyaan oo Yetroo ahaa, Muusena
soddog u ahaa, ayaa wuxuu maqlay kulli wixii Rabbigu
u sameeyey Muuse iyo dadkiisa reer binu Israa'iil, iyo sidii
Rabbigu reer binu Israa'iil uga soo bixiyey dalkii Masar. 2
Markaasaa Yetroo oo Muuse soddog u ahaa ayaa wuxuu
soo kexeeyey naagtii Muuse oo ahayd Siforaah, markuu iska
diray dabadeed, 3 iyadii iyo labadeedii wiilba, oo midkood
magiciisu wuxuu ahaa Gershoom, waayo, wuxuu yidhi,
Qariib baan ku ahaa dal qalaad, 4 midka kalena magiciisuna
wuxuu ahaa Eliiceser; waayo, wuxuu yidhi, Ilaahii aabbahay
baa i caawiyey, oo wuxuu iga samatabbixiyey seeftii Fircoon.
5 Markaasaa Yetroo oo Muuse soddog u ahaa ayaa Muuse
ugu yimid cidladii ay degeen oo buurtii Ilaah agteeda
ahayd isagoo wada wiilashiisii iyo naagtiisii. 6 Markaasuu
wuxuu Muuse ku yidhi, Anigoo ah Yetroo soddoggaa waan
kuu imid aniga iyo naagtaada iyadoo wadata labadeedii
wiilba. 7 Markaasaa Muuse dibadda u baxay inuu ka hor
tago soddoggiis, kolkaasuu u sujuuday oo dhunkaday,
markaasaa intay iswaraysteen ayay teendhadii soo galeen.

8 Markaasaa Muuse wuxuu soddoggiis u sheegay kulli wixii
Rabbigu ku sameeyey Fircoon iyo Masriyiintii oo uu ugu
sameeyey reer binu Israa'iil aawadood, iyo wixii dhib iyaga
ku dhacay oo dhan intay soo socdeen, iyo sidii Rabbigu
uga samatabbixiyey. 9 Markaasaa Yetroo ku farxay kulli
wanaaggii Rabbigu reer binu Israa'iil u sameeyey oo dhan,
iyo bixinta uu ka soo samatabbixiyey gacantii Masriyiinta. 10
Markaasaa Yetroo wuxuu yidhi, Ammaan waxaa leh Rabbigii
idinka soo samatabbixiyey gacantii Masriyiinta, iyo gacantii
Fircoon; oo kaasu waa kii dadka ka soo samatabbixiyey
gacantii Masriyiinta hoosteeda. 11 Oo haatan anigu waan
ogahay in Rabbigu ka wada weyn yahay ilaahyada oo
dhan; waayo, waxyaalihii ay kula macaamiloodeen iyagoo
kibirsan aawadeed, isagaa ka sarreeyey. 12 Markaasaa
Yetroo oo Muuse soddog u ahaa ayaa wuxuu qaaday
qurbaan la gubo iyo allabaryo. Markaasaa waxaa yimid
Haaruun iyo waayeelladii reer binu Israa'iil oo dhan inay
Ilaah hortiisa kibis kula cunaan Muuse soddoggiis. 13
Markaasaa waxaa maalintii dambe dhacday in Muuse u
fadhiistay inuu dadkii u kala gar naqo; dadkiina waxay
Muuse ag taagnaayeen subaxdii ilaa makhribkii. 14 Oo
Muuse soddoggiis markuu arkay wixii uu dadkii ku sameeyey
oo dhan ayuu yidhi, Waa maxay waxan aad dadka ku
samaynaysaa? Oo maxaad keligaa u fadhidaa, dadka oo
dhammuna kuu ag taagan yahay subaxda ilaa makhribka?
15 Markaasaa Muuse soddoggiis ku yidhi, Maxaa yeelay,
dadku waxay iigu yimaadaan inay Ilaah wax iga weyddiiyaan.
16 Oo markay wax isu haystaanna anigay ii yimaadaan, oo
markaasaan u kala gar naqaa nin iyo deriskiisa, oo waxaan
iyaga ogeysiiyaa amarrada Ilaah iyo qaynuunnadiisa. 17
Markaasaa Muuse soddoggiis wuxuu isaga ku yidhi, War
waxaad samaysaa ma wanaagsana. 18 Waayo, hubaal waad
ku daali doontaan, adiga iyo dadka kula joogaaba, maxaa
yeelay, waxanu waa kugu culus yihiin adiga; oo ma aad
awooddid inaad keli ahaantaa samayso. 19 Haddaba bal i
dhegayso oo waan kula talinayaaye, oo Ilaahna ha kula jiro.
Adigu dadka daraaddiis Ilaah u dhowow, oo arrimahoodana
Ilaah u keen. 20 Oo waa inaad iyaga bartaa amarrada
iyo qaynuunnada, oo waa inaad iyaga tustaa jidkii ay mari
lahaayeen, iyo shuqulkii ay qaban lahaayeen. 21 Oo weliba
waa inaad dadka oo dhan kala soo baxdaa rag karti leh,
oo Ilaah ka cabsada, oo daacad ah, oo neceb faa'iidada
xaqdarrada ah, oo kuwo caynkaas ah madax uga dhig, inay
ahaadaan kuwo kun kun u taliya, iyo kuwo boqol boqol u
taliya, iyo kuwo konton konton u taliya, iyo kuwo toban toban
u taliya, 22 oo kuwaasu dadka ha u gar naqeen had iyo
goor, oo waxay noqon doontaa in wixii weyn oo dhan ay
adiga kuu keenaan, laakiinse wixii yar oo dhan ay iyagu
ka gar naqi doonaan; oo sidaasaa hawshu kaaga yaraan
doontaa, oo iyana hawshay kula qaybsan doonaan. 23
Oo haddaad waxan samaysid, oo haddii Ilaah sidan kugu
amro, de markaas waad adkaysan kari doontaa, oo dadkan
oo dhammuna meeshooda ayay nabad ku tegi doonaan.
24 Sidaas daraaddeed Muuse wuu dhegaystay hadalkii
soddoggiis, wuuna wada sameeyey wixii uu ku yidhi oo
dhan. 25 Markaasaa Muuse wuxuu reer binu Israa'iil oo
dhan ka doortay rag karti leh, oo wuxuu ka dhigay madaxdii
dadka, oo ah kuwo kun kun u taliya, iyo kuwo boqol boqol u
taliya, iyo kuwo konton konton u taliya, iyo kuwo toban toban
u taliya. 26 Oo dadkay u gar naqi jireen had iyo goorba, oo
arrimaha adadagna waxay u keeni jireen Muuse, laakiinse
wixii yaryar oo dhan iyagaa ka gar naqi jiray. 27 Markaasaa
Muuse u oggolaaday soddoggiis inuu tago, isna dalkiisii
ayuu tegey.

19 Markii reer binu Israa'iil Masar ka soo bexeen
dabadeed, bishii saddexaad, ayay isla maalintaas
yimaadeen cidlada Siinay la yidhaahdo. 2 Oo markay ka
soo keceen Refiidiim oo ay yimaadeen cidladii Siinay ayay
teendhooyinkoodii cidladii ka dhisteen, oo reer binu Israa'iil
halkaasay degeen buurta horteeda. 3 Muusena kor buu ugu
tegey Ilaah, markaasaa Rabbigu buurta uga yeedhay isagii,
oo wuxuu ku yidhi, Yacquub reerkiisa waxaad ku tidhaahdaa
sidan, reer binu Israa'iilna ku dheh, 4 Idinku waad aragteen
wixii aan ku sameeyey Masriyiintii, iyo sidii aan idiinku soo
qaaday gorgorro baalashood, oo aan idiin soo kaxaystay.
5 Haddaba sidaas daraaddeed, haddaad daacad ahaan ii
addeecaysaan, oo aad axdigayga dhawraysaan, de markaas
waxaad ahaan doontaan dad hanti iiga ah dadyowga oo
dhan, waayo, dhulka oo dhan anigaa iska leh; 6 oo waxaad ii
ahaan doontaan boqortooyo wada wadaaddo ah, iyo quruun
quduus ah. Kuwanu waa erayada aad reer binu Israa'iil
kula hadli doonto. 7 Markaasaa Muuse yimid oo wuxuu u
yeedhay waayeelladii dadka oo dhan, kolkaasuu erayadii
Rabbigu isaga ku amray oo dhan hortooda wada dhigay. 8
Markaasaa dadkii oo dhammu waxay ku wada jawaabeen,
oo yidhaahdeen, Kulli waxa Rabbigu ku hadlay oo dhan
waannu wada yeeli doonnaa. Markaasaa Muuse Rabbiga
uga warramay erayadii dadka. 9 Kolkaasaa Rabbigu wuxuu
Muuse ku yidhi, Bal ogow, waxaan kuugu iman doonaa
daruur qaro weyn dhexdeed, inay dadku maqlaan markii aan
kula hadlayo, iyo weliba inay weligood adiga ku rumaystaan.
Markaasaa Muuse Rabbiga u sheegay erayadii dadka. 10
Kolkaasaa Rabbigu wuxuu Muuse ku yidhi, Bal orod oo

dadka u tag, oo maanta iyo berri quduus ka dhig iyaga,
oo dharkooda ha dhaqeen, 11 oo maalinta saddexaad
diyaar ha u noqdeen, waayo, maalinta saddexaad dadka
oo dhan hortiisa ayaa Rabbigu ku soo degi doonaa Buur
Siinay. 12 Oo waa inaad soohdin dadka kaga wareejisaa,
oo waxaad ku tidhaahdaa, Iska jira, oo buurta ha fuulina,
hana taabanina xuduudkeeda; waayo, ku alla kii buurta
taabta hubaal waa la dili doonaa. 13 Gacanu yaanay taaban
isaga, laakiinse hubaal isaga waa in la dhagxiyo ama waa in
gantaal lagu dilo; dad iyo duunyo ha ahaado, kaasu sina
yaanu u noolaan; oo markii buunka aad looga dhawaajiyo,
buurta ha soo fuuleen. 14 Markaasaa Muuse buurtii ka
degay, oo wuxuu u tegey dadkii, kolkaasuu dadkii quduus ka
dhigay, oo ay dharkoodii dhaqeen. 15 Oo wuxuu dadkii ku
yidhi, Maalinta saddexaad diyaar noqda oo naagna ha isugu
dhowaanina. 16 Oo maalintii saddexaad, markuu waagii
beryay, waxaa dhacay onkod iyo hillaac, oo daruur qaro
weyn baa buurtii soo dul joogsatay, oo waxaa yeedhay
buun codkiisu aad iyo aad u weyn yahay, kolkaasay dadkii
xerada ku jiray oo dhammu wada gariireen. 17 Markaasaa
Muuse dadkii xeradii ka soo bixiyey inay Ilaah la kulmaan
aawadeed; kolkaasay waxay istaageen buurta salkeedii.
18 Oo Buur Siinay dhammaanteed way qiiqaysay, maxaa
yeelay, Rabbi baa dusheeda ku soo degay, isagoo dab ku
dhex jira, oo qiiqeediina kor buu u baxay sida qiiq foorno oo
kale, oo buurtii oo dhammuna aad bay u gariirtay. 19 Oo
markii buunkii codkiisii aad iyo aad u sii weynaaday ayaa
Muuse hadlay, Ilaahna kolkaasuu cod ugu jawaabay. 20
Markaasaa Rabbigu wuxuu ku soo kor degay Buur Siinay,
oo wuxuu yimid buurta dusheedii. Kolkaasaa Rabbigu wuxuu
Muuse ugu yeedhay buurta dusheedii; oo Muusena kor buu
u baxay. 21 Markaasaa Rabbigu wuxuu Muuse ku yidhi,
Hoos u deg, oo dadka u dig, waaba intaasoo ay Rabbiga
xaggiisa u soo xadgudbaan inay fiirsadaan, oo ay qaarkood
badanu halligmaane. 22 Oo weliba wadaaddada Rabbiga u
soo dhowaanaya quduus ha iska dhigeen, waaba intaasoo
Rabbigu uu halligaaye. 23 Kolkaasaa Muuse wuxuu Rabbiga
ku yidhi, Dadku Buur Siinay sooma fuuli karaan, waayo,
waxaad nagu amartay, oo nagu tidhi, Buurta soohdin ku
wareeji, oo quduus ka dhig. 24 Markaasaa Rabbigu wuxuu
isagii ku yidhi, Orod oo hoos u deg; oo dabadeedna soo
fuul adigoo Haaruun wata; laakiinse wadaaddada iyo dadku
yaanay kor u soo xadgudbin xagga Rabbiga, waaba intaasoo
uu halligaaye. 25 Haddaba Muuse hoos buu u degay oo
dadkii u tegey, una sheegay.

20 Markaasaa Rabbigu erayadan oo dhan ku hadlay,
isagoo leh, 2 Anigu waxaan ahay Rabbiga Ilaahaaga
ah, oo kaa soo bixiyey dalkii Masar iyo gurigii addoonsiga. 3
Aniga mooyaane ilaahyo kale waa inaanad lahaan. 4 Waa
inaanad samaysan sanam xardhan, ama wax u eg waxa
samada sare jira, ama waxa dhulka hoose jira, ama waxa
biyaha dhulka ka hooseeya ku jira. 5 Waa inaanad iyaga
u sujuudin, ama u adeegin, waayo, aniga oo ah Rabbiga
Ilaahaaga ah waxaan ahay Ilaah masayr ah, oo xumaantii
awowayaasha waxaan soo gaadhsiinayaa carruurtooda tan
iyo farcanka saddexaad iyo kan afraad oo kuwa i neceb,
6 oo waxaan u naxariistaa kumanyaal ah kuwa i jecel
oo amarradayda xajiya. 7 Waa inaanad magaca Rabbiga
Ilaahaaga ah si been ah ugu hadal qaadin, waayo, Rabbigu
eedlaawe u haysan maayo kii magiciisa si been ah ugu hadal
qaada. 8 Xusuuso maalinta sabtida, inaad quduus ka dhigto.
9 Lix maalmood waa inaad hawshootaa, oo aad shuqulkaaga
oo dhan qabsataa, 10 laakiinse maalinta toddobaad waa
maalin sabti u ah Rabbiga Ilaahaaga ah, oo waa inaanad
shuqul qaban, adiga, ama wiilkaaga, ama gabadhaada, ama
addoonkaaga, ama addoontaada, ama xoolahaaga, ama
qariibka irdahaaga ku jira; 11 waayo, Rabbigu lix maalmood
buu ku sameeyey samada, iyo dhulka, iyo badda, iyo waxa
dhexdooda ku jira oo dhan, kolkaasuu nastay maalintii
toddobaad, sidaas daraaddeed ayaa Rabbigu u barakeeyey
maalintii sabtida ahayd oo quduus uga dhigay. 12 Aabbahaa
iyo hooyadaa maamuus, in cimrigaagu ku dheeraado dhulka
Rabbiga Ilaahaaga ahu ku siiyo. 13 Waa inaanad qudh gooyn.
14 Waa inaanad sinaysan. 15 Waa inaanad waxba xadin. 16
Waa inaanad deriskaaga marag been ah ku furin. 17 Waa
inaanad damcin guriga deriskaaga, waa inaanad damcin
naagta deriskaaga, ama addoonkiisa, ama addoontiisa, ama
dibigiisa, ama dameerkiisa, ama waxa deriskaagu leeyahay
oo dhan. 18 Oo dadkii oo dhammuna way wada arkeen
onkodkii iyo hillaacii, iyo codkii buunka, iyo buurtii qiiqaysay;
oo markii dadkii arkay ayay gariireen, oo meel fog istaageen.
19 Kolkaasay waxay Muuse ku yidhaahdeen, Adigu nala
hadal, oo annana waannu ku maqli doonnaa, laakiinse Ilaah
yuusan nala hadlin, waaba intaasoo aannu dhimannaaye. 20
Markaasaa Muuse wuxuu dadkii ku yidhi, Ha cabsanina,
waayo, Ilaah wuxuu u yimid inuu idin tijaabiyo, iyo in ka
cabsashadiisu idinku jirto, si aydnaan u dembaabin. 21
Markaasaa dadkii waxay istaageen meel fog, Muusena
wuxuu u soo dhowaaday gudcurkii qarada weynaa oo Ilaah
joogay. 22 Markaasaa Rabbigu wuxuu Muuse ku yidhi,
Waxaad reer binu Israa'iil ku tidhaahdaa, Idinka qudhiinnu
waad aragteen inaan samada idinkala hadlay. 23 Haddaba

waa inaydnaan yeelan ilaahyo kale aniga mooyaane; oo
ilaahyo lacag ah iyo ilaahyo dahab ah waa inaydnaan
samaysan. 24 Meel allabari waa inaad ciid iiga samaysaa,
oo waa inaad dusheeda iigu bixisaa qurbaannadaada la
gubo, iyo qurbaannadaada nabaadiinada, iyo idahaaga iyo
dibiyadaada. Oo meel kasta oo aan magacayga dadka
ku xusuusiyoba waan kuugu iman doonaa oo waan kugu
barakayn doonaa. 25 Oo haddaad meel allabari dhagax iiga
samayso, waa inaadan dhagax qoran ka dhisin, waayo,
haddaad alaabtaada taabsiisid waad nijaasaysay. 26 Ama
waa inaanad meeshayda allabariga sallaan ku fuulin, si aan
cawradaadu uga muuqan.

21 Haddaba kuwanu waa amarradii aad hortooda dhigi
lahayd. 2 Haddaad addoon Cibraani ah iibsatid, ha
kuu adeego lix sannadood, oo tan toddobaadna ha iska tago
isagoo xor ah oo aan waxba bixin. 3 Oo hadduu keli ahaantiis
ku soo galo, haddana keli ahaantiis ha ku baxo, hadduuse
naag qabo, de markaas waa inay naagtiisu isaga la baxdaa.
4 Haddii sayidkiisu naag siiyona, oo ay wiilal iyo gabdho u
dhasho, de markaas naagta iyo carruurteedaba waxaa iska
lahaanaya sayidkeedii, oo waa inuu isagu keligiis iska baxaa.
5 Laakiinse haddii addoonku bayaan u yidhaahdo, Anigu
waan jeclahay sayidkayga, iyo naagtayda, iyo carruurtayda,
oo anigoo xor ah bixi maayo, 6 de markaas waa in sayidkiisu
xaakinnada u keenaa, oo waa inuu albaabka ag keenaa,
ama tiirka albaabka; markaas sayidkiisu dhegta mudac
ha kaga dalooliyo; oo weligiis ha u adeego. 7 Oo haddii
nin gabadhiisa u iibiyo inay addoon noqoto, waa inaanay
dibadda u bixin sida addoommada nimanka ahu ay u baxaan.
8 Oo haddaanay raalli gelin sayidkeedii doonay iyada, de
markaas waa inuu sii daayo iyada, ha la madax furto,
laakiinse amar uma lahaan doono inuu iyada dad qalaad ka
iibiyo, waayo, khiyaano ayuu kula macaamilooday iyada. 9
Oo hadduu iyada wiilkiisa u guursho, de waa inuu iyada ula
macaamiloodaa sida gabdhaha loola macaamiloodo. 10 Oo
hadduu naag kale la guursado, waa inuusan inna ka dhimin
masruufkeeda, iyo dharkeeda, iyo xaqa naagnimadeeda.
11 Oo hadduusan saddexdaas iyada u samayn, markaas
lacagla'aan ha ku baxdo. 12 Kii nin wax ku dhufta si uu ninku
u dhinto, isagana hubaal waa in la dilaa. 13 Oo haddii aanu
gaadin, laakiinse Ilaah u dhiibo gacantiisa, de markaas anaa
kuu samayn doona meel uu ku cararo. 14 Oo haddii nin kibir
ula badheedho inuu deriskiisa khiyaano ku dilo, waa inaad
isaga ka waddaa meeshayda allabariga, ha dhintee. 15 Oo
kii aabbihiis ama hooyadiis wax ku dhufta, hubaal kaas waa
in la dilaa. 16 Oo kii intuu nin xada iibiya ama gacantiisaba
laga helo, hubaal kaas waa in la dilaa. 17 Oo kii aabbihiis
ama hooyadiis caaya, hubaal kaas waa in la dilaa. 18 Oo
haddii niman diriraan, oo midkood kan kale dhagax ama
feedh ku dhufto, oo uusan dhiman, laakiinse uu sariir ku jiif
noqdo; 19 kaasu hadduu mar kale sara kaco oo uu dibadda u
baxo isagoo ushiisa ku tukubaya, markaas kii wax ku dhuftay
eed ma leh, laakiinse waa inuu siiyaa wixii ka khasaaroobay
intuu jiifay, waana inuu dhaqaaleeyo ilaa uu ka bogsado. 20
Haddii nin addoonkiisa ama addoontiisa uu ul ku dhufto, oo
uu gacantiisa ku dhinto, kaas hubaal waa in la ciqaabaa.
21 Kan la dilayse hadduu maalin ama laba sii joogo, de
markaas waa inaan la ciqaabin, waayo, isagu waa lacagtiisii.
22 Oo haddii niman diriraan oo ay wax yeelaan naag uur
leh, oo uu ilmaheedu ka soo dhaco, laakiinse dhib kale
aanu dhicin, kaas waa in lagu ganaaxaa intii ninkii naagta
qabay uu kor saaro, oo waa inuu bixiyaa intii xaakinnadu ku
xukumaan. 23 Laakiinse haddii dhib kale dhacdo, waa inaad
naf naf u dishaa, 24 oo waa inaad il il u riddaa, iligna ilig u
riddaa, gacanna gacan u gooysaa, cagna cag u gooysaa, 25
oo kii wax guba, gub, kii wax dhaawacana, dhaawac, kii wax
karbaashana, karbaash. 26 Oo haddii nin isha addoonkiisa
ama isha addoontiisa wax ku dhufto, oo ka rido, de markaas
waa inuu iska sii daayaa isagoo xor ah, ishiisa aawadeed.
27 Oo hadduu iligga addoonkiisa ama iligga addoontiisa wax
ku dhufto oo ka rido, de markaas waa inuu iska sii daayaa
isagoo xor ah iliggiisa aawadiis. 28 Oo haddii dibi nin ama
naag geeso ku mudo, oo ay dhintaan, markaas hubaal waa
in dibiga la dhagxiyaa, oo hilibkiisana waa inaan la cunin;
laakiinse qofkii dibiga lahaa waxba eed ma leh. 29 Laakiinse
haddii markii hore dibigu dad geesaha ku mudi jiray, oo
loo sheegay qofkii lahaa, isaguse aanu xidhin, laakiinse uu
dibigu nin ama naag dilay, dibiga waa in la dhagxiyaa, oo
weliba qofkii lahaana waa in isna la dilaa. 30 Haddiise mag
la saaro isaga, de markaas waa inuu bixiyaa wax alla wixii la
kor saaray madaxfurashadiisa aawadeed. 31 Hadduu wiil
geeso ku muday iyo hadduu gabadh geeso ku mudayba
waa in xukunkan lagu qaadaa. 32 Oo haddii dibigii geeso
ku mudo nin addoon ah ama naag addoon ah, waa inuu
ninkii dibiga lahaa sayidkoodii soddon sheqel oo lacag ah
siiyaa, oo dibigana waa in la dhagxiyaa. 33 Oo haddii nin
god daboolka ka qaado, ama haddii nin god qodo oo uu
dabooli waayo, oo uu ama dibi ama dameer ku dhaco, 34 de
markaas waa in ninkii godka lahaa xaq mariyaa. Waa inuu
lacag siiyaa ninkii neefka lahaa, oo neefka dhintayna waa
inuu isagu lahaado. 35 Oo haddii nin dibigiis nin kale dibigiis
wax yeelo oo uu dhinto, de markaas waa inay dibiga nool
iibiyaan, oo qiimihiisa waa inay qaybsadaan; oo weliba kan

dhintayna waa inay qaybsadaan. 36 Ama haddii dibiga lagu yiqiin inuu markii hore wax geeso ku mudi jiray, oo uusan qofkii lahaa xidhin, markaas hubaal waa inuu dibi dibi ku bixiyaa, oo neefka dhintayna waa inuu isagu lahaado.

22 Haddii nin dibi ama lax xado, oo uu qasho ama iibiyo, waa inuu shan dibi dibigii ku magdhabo, laxdiina afar laxaad. 2 Haddii tuug la helo isagoo guri u dhacaya, oo inta wax lagu dhufto uu dhinto, markaas kii dilay dhiig eed kuma laha. 3 Haddiise qorraxdu u soo baxdo, markaas dhiigga eed buu ku leeyahay. Waa inuu u soo celiyaa, hadduusanse waxba haysan, de markaas waa in isaga la iibiyaa tuugnimadiisii aawadeed. 4 Haddiise wuxuu xaday iyagoo nool gacantiisa laga helo, ama dibi ha noqdo amase dameer, amase lax, waa inuu labanlaab u bixiyaa. 5 Haddii nin beer canab ah ama beer kale xoolo daajiyo, oo uu neefkiisa ku sii daayo si uu nin kale beertiis u daaqo, de markaas waa inuu meesha beertiisa ugu wanaagsan iyo meesha beertiisa canabka ah ugu wanaagsan ugu magdhabaa. 6 Haddii dab baxo, oo uu qodxanta qabsado, oo uu wada gubo xidhmooyinka sarreenka ah ama sarreenka weli baalka ku yaal, ama beerta oo dhan, markaas kii dabka shiday waa inuu magdhabaa. 7 Haddii nin deriskiisa lacag ama alaab ammaano ugu dhiibto, oo ninka gurigiisii laga xado, oo markaas tuuggii la helo, waa inuu labanlaab u magdhabaa. 8 Haddiise aan tuuggii la helin, markaas waa in ninkii guriga lahaa xaakinnada u soo dhowaadaa si loo caddeeyo inuu alaabtii deriskiisa fartiisa saaray iyo in kale. 9 Waayo, wax kasta oo xadgudub ah ama ha noqdo dibi aawadiis, ama dameer aawadiis, ama lax aawadeed, ama dhar aawadiis, ama wax kasta oo baadi ah, haddii la leeyahay, Waa kan, waa in labada qolo arrintooda xaakinnada la hor keenaa. Oo midkii xaakinnadu ku xukumaan waa inuu deriskiisa labanlaab ugu magdhabaa. 10 Haddii nin deriskiisa ammaano ugu dhiibto dameer ama dibi, ama lax amase neef uun, markaas hadduu dhinto, ama wax gaadhaan, ama la kaxaysto iyadoo aan la arkayn, 11 markaas waa in dhaartii Rabbiga la dhex dhigaa labadooda, si loo caddeeyo inuu fartiisa saaray xoolihii deriskiisa iyo in kale, oo kii lahaana waa inuu aqbalaa, oo waxbana loo magdhabi maayo. 12 Laakiinse haddii laga xado, waa inuu isagu qofkii lahaa u magdhabaa. 13 Haddiise dugaag bakhtiisto, waa inuu marag ahaan u keenaa, oo wixii dugaaggu bakhtiistay waxba ka magdhabi maayo. 14 Oo haddii nin deriskiisa neef ka ammaahdo, oo ay wax gaadhaan amaba uu dhinto, isagoo aan ninkii lahaa la joogin, kaasu hubaal waa inuu magdhabaa. 15 Haddiise kii lahaa la joogay, waa inuusan waxba ka magdhabin, oo hadduu kiro ahaa, kiradiisii waa laga xisaabay. 16 Oo haddii nin sasabto gabadh bikrad ah oo aan doonanayn, oo uu iyada la seexdo, de markaas waa inuu yarad ka bixiyo oo uu guursadaa iyada. 17 Haddiise aabbeheed innaba u diido inuu isaga siiyo, de markaas waa inuu bixiyaa intii gabadh bikrad ah yaradkeedu yahay. 18 Saaxirad inay sii noolaato waa inaadan u fasaxin. 19 Ku alla kii neef u galmooda, hubaal waa in la dilaa. 20 Kii wax u bixiya ilaah kale oo aan Rabbiga keligiis ah ahayn, kaas waa in dhammaantiis la baabbi'iyaa. 21 Oo qariib waa inaadan xumayn, ama waa inaadan dulmin, waayo, idinba qariib baad ku ahaydeen dalkii Masar. 22 Waa inaydnaan dhibin carmal, ama ilmo agoon ah. 23 Oo si kasta ha noqotee haddii aad iyaga dhibtid, oo ay ii qayshadaan hubaal qayladooda waan maqli doonaa, 24 oo aad baan u cadhoon doonaa, oo markaasaan seef idinku dili doonaa, kolkaasaa naagihiinnu waxay noqon doonaan carmallo, carruurtiinnuna agoon. 25 Oo haddaad lacag ammaahisid dadkayga masaakiinta ah oo kula jooga, waa inaadan ku noqon sidii mid dayn ku leh ama waa inaadan waxba kor saarin. 26 Haddaad deriskaaga dharkiisa rahmad uga qaadatid waa inaad u celisaa intaan qorraxdu dhicin, 27 waayo, kaasu waa kan qudh ah oo uu isa saari jiray, oo waa dharkii uu huwan jiray, oo muxuu ku seexan doonaa? Oo waxaa dhici doonta in markuu ii qayshado, aan maqli doono, waayo, anigu waan raxmad badnahay. 28 Waa inaadan xaakinnada caayin, mid dadkaaga u taliyana ha habaarin. 29 Waa inaadan ka raagin inaad wax ka bixiso midhahaaga badan iyo dheecaanka macsaraddaada. Oo curadyada dadkaagana waa inaad aniga i siisaa. 30 Oo sidaas oo kalena waa inaad ka yeeshaa dibiyadaada iyo idahaaga; toddoba maalmood waa inuu hooyadiis la joogaa, maalinta siddeedaadna waa inaad ii bixisaa. 31 Oo waa inaad dad quduus ah ii ahaataan, oo sidaas daraaddeed waa inaydnaan cunin hilib neef oo dugaag berrinka ku bakhtiistay, laakiinse waa inaad eeyaha u tuurtaan.

23 Waa inaadan qaadqaadin war been ah; gacantaada heshiis ha ugu dhiibin kan sharka ah, yaadan markhaati xaqdaran noqone. 2 Inaad xumaan fashid aawadeed dad badan ha u raacin, ama marag ha furin oo dad badan dhankooda ha u leexan inaad gar qalloocisaan, 3 waana inaadan nin miskiin ah u gar eexan. 4 Haddaad aragtid cadowgaaga dibigiisii ama dameerkiisii oo lumaya, waa inaad u celisaa. 5 Haddaad aragtid kan ku neceb dameerkiisii oo rar la dhacay, oo aanad doonayn inaad caawiso, hubaal waa inaad caawisaa. 6 Miskiinkaaga dacwaddiisa waa inaadan

garta ka qalloocin. 7 Wax been ah ka fogow; oo ha dilin mid
aan eed lahayn iyo kan xaqa ah; waayo, anigu xaq ka dhigi
maayo kan shar fala. 8 Oo waa inaadan laaluush qaadan
innaba; waayo, laaluushku waa indho tiraa kuwa wax arka,
wuuna qallooociyaa kan xaqa ah hadalkiisa. 9 Oo qariib waa
inaadan dulmin; waayo, qalbiga qariibka waad garanaysaan,
maxaa yeelay, idinba qariib baad dalkii Masar ku ahaydeen.
10 Lix sannadood waa inaad dhulkaaga wax ku abuurtaa
oo midhihiisa urursataa, 11 laakiinse sannadda toddobaad
waa inaad iska daysaa ha nasto, oo dhul aan beernayn
ha noqdee, inay masaakiinta dadkaagu wax ka cunaan;
oo waxay reebaanna dugaagga duurku ha daaqeen. Oo
sidaas oo kalena waa inaad u gashaa beertaada canabka
ah iyo beertaada saytuunka ah. 12 Lix maalmood waa inaad
shuqulkaaga qabsataa, oo maalinta toddobaadna waa inaad
nasataa, si ay dibigaaga iyo dameerkaaguna u nastaan,
oo ay wiilka addoontaada iyo kan qariibka ahuba nafis
u helaan. 13 Oo kulli wixii aan idinku idhi oo dhan waa
inaad aad u dhawrtaan, oo ilaahyo kale magacood ha soo
qaadina innaba, ama afkaagaba yaan laga maqlin. 14 Oo
sannad walba saddex goor waa inaad ii iiddaa. 15 Oo Iiddii
Kibista-aan-khamiirka-lahayn waa inaad dhawrtaa. Toddoba
maalmood waa inaad cuntaa kibis aan khamiir lahayn, sidii
aan kugu amray wakhtigii la yidhi oo bisha Aabiib ah, maxaa
yeelay, bishaas ayaad Masar ka soo baxday; oo midkiinna
hortayda yuusan iman isagoo faro madhan. 16 Oo waa
inaad dhawrtaa Iiddii Beergoosadka oo ah midhihii ugu
horreeyey hawshaada aad beerta ku abuurtay, iyo Iiddii
Wax urursiga oo sannadda dhammaadkeeda ah, marka
aad soo urursatid midhihii aad beerta ku hawshootay. 17
Kuwaaga labka ah oo dhammu waa inay sannad walba
saddex goor Rabbiga Ilaaha ah ka hor yimaadaan. 18 Oo
waa inaadan dhiigga allabarigayga la bixin kibis khamiir
leh; baruurta iiddayduna waa inaanay hadhin habeenka oo
dhan ilaa subaxda. 19 Oo dhulkaaga midhaha ugu horreeya
waa inaad inta hore guriga Rabbiga Ilaahaaga ah geeysaa.
Waa inaadan waxar caanaha hooyadiis ku karin. 20 Bal
eeg, waxaan hortaada u soo dirayaa malaa'ig, inay jidka
kugu dhawrto oo ay meeshii aan diyaarshay ku geeyso. 21
Iyada iska jira, oo codkeeda dhegaysta, hana ka xanaajinina,
waayo, iyadu xadgudubkiinna idinkama cafiyi doonto; maxaa
yeelay, iyada magacaygii baa ku dhex jira. 22 Laakiinse
xaqiiqa haddaad codkeeda dhegaysatid, oo aad yeeshid
kulli waxa aan ku hadlayo, de markaas waxaan noqon
cadaawayaashaada cadowgooda, oo kuwa ku dhibana mid
dhiba iyaga. 23 Waayo, malaa'igtaydu way ku hor socon
doontaa, oo waxay ku dhex geeyn doontaa reer Amor, iyo
reer Xeed, iyo reer Feres, iyo reer Kancaan, iyo reer Xiwi,
iyo reer Yebuus; oo kolkaasaan iyaga baabbi'in doonaa.
24 Waa inaadan u sujuudin ilaahyadooda, hana u adeegin,
shuqulkooda oo kalena ha samayn; laakiinse waa inaad
wada afgembidaa, oo aad sanamyadoodana jejebisaa. 25 Oo
waa inaad Rabbiga Ilaahiinna ah u adeegtaan, oo isaguna
wuu idiin barakayn doonaa kibistiinna iyo biyihiinna; oo
anna cudur waan ka fogayn doonaa dhexdiinna. 26 Oo
dhulkaaga dhexdiisa miduna dhicis ma dhali doonto, ama
madhalays ma noqon doonto, oo tirada maalmahaaga waan
dhammaystiri doonaa. 27 Oo cabsidaydaan ku hor marin
doonaa, oo dadka aad u tegaysid oo dhan waan argaggixin
doonaa, oo waxaan cadaawayaashaada oo dhan ka dhigi
doonaa inay dhabarkooda kaa sii jeediyaan. 28 Oo waxaan
hortaa diri doonaa xoon, kaas oo reer Xiwi, iyo reer Kancaan,
iyo reer Xeed hortaada ka eryi doona. 29 Oo iyaga sannad
uun hortaada ka eryi maayo, waayo, waaba intaasoo dhulku
cidla noqdaa, oo dugaagga duurku kugu bataa. 30 In yar in
yar ayaan hortaada ka eryi doonaa, ilaa aad adigu badatid
oo aad dalka dhaxashid. 31 Oo waxaan soohdintaada ka
dhigi doonaa Badda Cas iyo tan iyo badda reer Falastiin, iyo
cidlada ilaa tan iyo Webiga, waayo, dadka dhulka deggan
waxaan gelin doonaa gacantaada, markaasaad hortaada
ka eryi doontaa. 32 Waa inaadan axdi la dhigan iyaga
iyo ilaahyadooda toona. 33 Waa inayan iyagu dalkaaga
degganaan, waaba intaasoo ay igu kaa dembaajiyaane,
waayo, haddaad ilaahyadooda u adeegtid, hubaal waxay
taasu kugu noqon doontaa dabin.

**24** Markaasuu wuxuu Muuse ku yidhi, Soo fuula oo
Rabbiga u kaalaya, adiga iyo Haaruun, iyo Naadaab,
iyo Abiihuu, iyo toddobaatan oday oo reer binu Israa'iil ah,
oo meel fog ka caabuda; 2 oo Muuse oo keliyahu waa inuu
Rabbiga u soo dhowaada, laakiinse iyagu waa inayan soo
dhowaan, dadkuna yuusan la soo fuulin. 3 Markaasaa Muuse
dadkii u yimid, oo wuxuu u sheegay hadalladii Rabbiga oo
dhan iyo amarradii oo dhan. Markaasaa dadkii oo dhammu
isku cod ku jawaabeen, oo waxay yidhaahdeen, Ereyadii
Rabbigu ku hadlay oo dhan waannu wada yeeli doonnaa.
4 Markaasaa Muuse wuxuu qoray ereyadii Rabbiga oo
dhan, kolkaasuu aroor hore kacay, oo buurta hoosteedii
wuxuu ka dhisay meel allabari iyo laba iyo toban tiir, sidii
laba iyo tobankii qolo oo reer binu Israa'iil ay ahaayeen. 5
Kolkaasuu wuxuu diray raggii dhallinyarada ahaa oo reer
binu Israa'iil, oo waxay Rabbiga u bixiyeen allabaryo la
gubo iyo qurbaanno nabaadiino oo dibiyo ah. 6 Markaasaa
Muuse wuxuu qaaday dhiiggii badhkiis oo wuxuu ku shubay
xeedhooyin; oo dhiiggii badhkiisna wuxuu ku rusheeyey

meeshii allabariga. 7 Markaasuu wuxuu qaaday kitaabkii
axdiga, oo wuuna akhriyey iyadoo ay dadkii maqlayaan, oo
waxay yidhaahdeen, Kulli wixii Rabbigu ku hadlay waannu
yeeli doonnaa oo waannu addeeci doonnaa. 8 Markaasaa
Muuse wuxuu qaaday dhiiggii, oo dadkii ku rusheeyey, oo
wuxuu ku yidhi, Bal eega dhiiggii axdiga oo Rabbigu idinla
dhigtay oo ku saabsan hadalladan oo dhan. 9 Kolkaasaa
waxaa kor u fuulay Muuse, iyo Haaruun, iyo Naadaab, iyo
Abiihuu, iyo toddobaatan oday oo reer binu Israa'iil ah. 10
Markaasay waxay arkeen Ilaahii reer binu Israa'iil; oo waxaa
cagihiisa ka hooseeyey sallax dhagax safayr ah oo sida
samada u daahirsan. 11 Oo odayaashii reer binu Israa'iilna
far ma uu saarin, oo Ilaah bay arkeen, waxna way cuneen
oo cabbeen. 12 Markaasaa Rabbigu wuxuu Muuse ku yidhi,
Bal kaalay oo buurta ii soo fuul, oo halkaas iska joog; oo
waxaan ku siinayaa looxyada dhagaxa ah, iyo sharcigii iyo
qaynuunnadii aan qoray, inaad iyaga bartid. 13 Kolkaasaa
Muuse sara kacay, isaga iyo midiidinkiisii Yashuuca, oo
Muuse wuxuu fuulay buurtii Ilaah. 14 Oo wuxuu odayaashii
ku yidhi, Idinku halkan noo jooga, ilaa aan mar kale idiin
nimaadno, oo bal eega, waxaa idinla jooga Haaruun iyo
Xuur; ku alla kii dacwo qaba, iyaga ha u yimaado. 15
Markaasaa Muuse wuxuu fuulay buurtii, oo buurtiina waxaa
qarisay daruur. 16 Oo ammaantii Rabbiguna waxay dul
joogtay Buur Siinay, oo daruurtuna way qarinaysay intii lix
maalmood ah, oo maalintii toddobaad ayaa Rabbigu Muuse
uga dhex yeedhay daruurtii. 17 Oo muuqashada ammaantii
Rabbigu waxay reer binu Israa'iil ula ekayd sidii dab wax
gubaya buurta dusheeda. 18 Markaasaa Muuse wuxuu galay
daruurtii dhexdeeda, oo buurtuu fuulay; oo Muuse wuxuu
buurtii fuushanaa afartan maalmood iyo afartan habeen.

**25** Markaasaa Rabbigu wuxuu la hadlay Muuse, oo ku
yidhi, 2 Waxaad reer binu Israa'iil ku tidhaahdaa,
Rabbigu wuxuu leeyahay, Qurbaan ii ururiya, oo nin kasta
oo qalbigiisu raalli ka yahay waa inaad ka qaaddaa
qurbaankayga. 3 Oo qurbaanka aad ka qaadayso waxa
weeyaan: dahab, iyo lacag, iyo naxaas, 4 iyo buluug, iyo
guduud, iyo casaan, iyo maro wanaagsan, iyo dhogor riyaad,
5 iyo wanan hargahood oo la caseeyey, iyo adhidibadeed
hargahood, iyo qori qudhac ah, 6 iyo saliid laambadda
lagu shubo, iyo udgoon lagu daro saliidda lagu subkado,
iyo dhir udgoon oo lagu daro uunsiga; 7 iyo dhagaxyo
onika la yidhaahdo, iyo dhagaxyo loogu dhejiyo eefodka, iyo
laabgashiga. 8 Oo meel quduus ah ha ii sameeyeen aan
iyaga dhex joogee. 9 Waxaan ku tusi doono oo dhan, oo ah
hannaanka taambuugga iyo hannaanka alaabtiisa oo dhan,
waa inaad sidaas oo kale u samaysaan. 10 Oo waa inay
sanduuq ka sameeyaan qori qudhac ah, oo dhererkiisuna
waa inuu ahaadaa laba dhudhun iyo badh, ballaadhkiisuna
waa inuu ahaadaa dhudhun iyo badh, sarajooggiisuna waa
inuu ahaadaa dhudhun iyo badh. 11 Oo waa inaad ku
dahaadhaa dahab saafi ah, oo gudaha iyo dibaddaba waa
inaad ka dahaadhaa, oo dushiisana waa inaad u samaysaa
wax taaj oo kale ah oo dahab ah oo ku wareegsan. 12 Oo
waa inaad afar siddo oo dahab ah u yeeshaa, oo aad kaga
dhejisaa afarta rukun, oo laba siddo waa inay isku dhinac ku
yaalliin, laba siddona waa inay dhinaciisa kale ku yaalliin. 13
Oo waa inaad ulo ka samaysaa qori qudhac ah, waana inaad
dahab ku dahaadhaa. 14 Oo ulahana waa inaad gelisaa
siddooyinka sanduuqa dhinacyadiisa ku yaal, in sanduuqa
lagu qaado. 15 Oo uluhu waa inay ku jiraan sanduuqa
siddooyinkiisa; oo waana inaan iyaga laga bixin marnaba. 16
Oo sanduuqa gudihiisana waa inaad ku riddaa maragga aan
ku siin doono. 17 Oo daboolna waa inaad uga samaysaa
dahab saafi ah; laba dhudhun iyo badh waa inuu dhererkiisu
ahaadaa, ballaadhkiisuna waa inuu ahaadaa dhudhun iyo
badh. 18 Oo waa inaad laba keruub ka samaysaa dahab la
tumay iyagoo daboolka labadiisa madax ka soo taagan. 19
Keruub waa inaad madax ka samaysaa, keruubka kalena
waa inaad madaxa kale ka samaysaa; oo labada keruub
oo labada madax ka kala taagan iyo daboolka waa inaad
isku waslad ka wada samaysaan. 20 Oo keruubiimtu waa
inay baalashooda meel sare ka soo kala bixiyaan, iyagoo
baalashooda ku qarinaya daboolka, oo wejiyadoodu isku soo
jeedaan, oo keruubiimta wejiyadooduna waa inay ku soo
jeedaan daboolka. 21 Oo daboolkana waa inaad sanduuqa
dushiisa saartaa; oo sanduuqa gudihiisana waa inaad ku
riddaa maragga aan ku siin doono. 22 Oo halkaasaan kugula
kulmi doonaa, oo waxaan kaala hadli doonaa daboolka
dushiisa, iyo labada keruub oo sanduuqa maragga dul saaran
dhexdooda, oo waxaan kuu sheegi doonaa waxyaalaha aan
ku siin doono oo dhan oo aan amar ahaan kuugu dhiibi
doono reer binu Israa'iil. 23 Oo waa inaad miis ka samaysaa
qori qudhac ah, oo dhererkiisu ha ahaado laba dhudhun,
ballaadhkiisuna ha ahaado dhudhun, sarajooggiisuna ha
ahaado dhudhun iyo badh. 24 Oo waa inaad dahab saafi ah
ku dahaadhaa, waana inaad u samaysaa wax taaj oo kale
ah oo dahab ah oo ku wareegsan. 25 Oo waa inaad qar
le'eg calaacal ballaadhkeed oo ku wareegsan u samaysaa,
oo waa inaad qarka u samaysaa wax taaj oo kale ah oo
dahab ah oo ku wada wareegsan. 26 Oo waa inaad afar
siddo oo dahab ah u yeeshaa, oo siddooyinkana waa inaad
ku dhejisaa afarta gees oo rukummada ah. 27 Oo meel

qarka ku dhow waa inay siddooyinku ku yaalliin, iyagoo ah
meelaha laga geliyo ulaha miiska lagu qaado. 28 Oo ulaha
waa inaad qori qudhac ah ka samaysaa, oo aad dahab ku
dahaadhaa, in miiska lagu qaado iyaga. 29 Oo waa inaad u
samaysaa suxuuntiisa, iyo malqacadihiisa, iyo kidhliyadiisa,
iyo maddiibadihiisa wax lagaga shubo, oo waa inaad dahab
saafi ah ka wada samaysaa. 30 Oo miiska dushiisana waa
inaad kibistii tusniinta saartaa, hana taallo hortayda had
iyo goorba. 31 Oo laambad waa inaad dahab saafi ah
ka samaysaa, oo laambaddii waa in dahab laga tumaa,
xataa salkeeda iyo usheeda dhexe, iyo koobabkeeda, iyo
burooyinkeeda, iyo ubaxeeduba, waa inay isku waslad la
ahaadaan. 32 Dhinacyadana waa in lix laamood ka baxdaa;
saddex laamood waa inay laambadda dhinac kaga yaalliin,
saddexda kalena waa inay dhinaca kale kaga yaalliin. 33
Saddex koob oo yicib ubaxeed u eg, iyo buro iyo ubax waa
inay isku laan ku yaalliin, oo saddex koob oo yicib ubaxeed
u eg iyo buro iyo ubaxna waa inay ku yaalliin laanta kale; oo
lixda laamood oo laambadda ka baxdaa waa inay sidaas
wada ahaadaan. 34 Oo laambadduna waa inay lahaataa
afar koob oo u eg yicib ubaxeed, iyo burooyinkoodii, iyo
ubaxoodii; 35 iyo buro oo laba laamood ka hoosaysa oo
ay isku waslad la yihiin, iyo buro kale oo laba laamood ka
hoosaysa oo ay isku waslad la yihiin, iyo buro kale oo laba
laamood ka hoosaysa oo ay isku waslad la yihiin, oo waa
inay lixda laamood oo laambadda ka baxday sidaas wada
ahaadaan. 36 Burooyinkooda iyo laamahooduba waa inay
isku waslad la ahaadaan, oo kulligeedna waa inay ahaataa
isku waslad dahab la tumay oo saafi ah. 37 Oo waa inaad
toddoba laambadood ka dhigtaa, oo laambadaheeda waa in
la shidaa inay hortooda iftiimiyaan. 38 Oo birqaabyadeeda
iyo alaabteeda lagu safeeyoba waa inay dahab saafi ah
ahaadaan. 39 Oo iyada iyo alaabtan oo dhanba waa in
talanti dahab saafi ah laga sameeyaa. 40 Oo sida hannaankii
lagugu tusay buurta waa inaad u samaysaa.

**26** Oo weliba waa inaad samaysaa taambuugga toban
daah leh, oo waxaad ka samaysaa maro wanaagsan,
iyo buluug, iyo guduud, iyo casaan, oo lagu daabacay
keruubiim. 2 Oo daah walba dhererkiisu waa inuu ahaadaa
siddeed iyo labaatan dhudhun, daah walba ballaadhkiisuna
waa inuu ahaadaa afar dhudhun; oo daahyada oo dhammuna
waa inay isku qiyaas ahaadaan. 3 Shan daah waa inay
isku xidhnaadaan, oo shanta daah oo kalena waa inay
isku wada xidhnaadaan. 4 Oo daahyada midkood waa
inaad darafta uu ka laaban yahay u yeeshaa siddooyin
buluug ah, oo sidaas oo kalena waa inaad ka yeeshaa
daaha dibadda ugu xiga laabka labaad. 5 Isku daah waa
inaad konton siddo u yeeshaa; oo daaha ku yaal laabka
labaad waa inaad daraftiisa u yeeshaa konton siddo; oo
siddooyinkuna waa in midkoodba kan kale ka hor jeedaa.
6 Waa inaad konton qabsato oo dahab ah samaysaa, oo
daahyadana waa inaad midba kan kale qabsatooyinka kula
xidhaa, oo taambuuggana waa inuu mid dhan ahaadaa. 7
Oo waa inaad daahyo ah dhogor riyaad samaysaa oo aad
taambuugga ku deddaa; oo waa inaad iyaga ka dhigtaa
koob iyo toban daah. 8 Oo daah kasta dhererkiisu waa inuu
soddon dhudhun ahaadaa, daah kasta ballaadhkiisuna waa
inuu afar dhudhun ahaadaa; oo koob iyo tobanka daah waa
inay isku qiyaas ahaadaan. 9 Oo waa inaad shan daah gooni
ahaantooda isugu xidhaa, lix daahna gooni ahaantooda
isugu xidh, oo daaha lixaad waa inaad ku labanlaabtaa
teendhada fooddeeda. 10 Oo daaha dibadda u xiga laabka
daraftiisa waa inaad konton siddo u yeeshaa, oo daaha
laabka labaad ugu korreeya daraftiisana waa inaad konton
siddo u yeeshaa. 11 Oo waa inaad samaysaa konton qabsato
oo naxaas ah, oo waa inaad qabsatooyinkana sudhaa
siddooyinka, oo teendhadana isku xidh kulligeed si ay mid
dhan u noqoto. 12 Oo inta dusha ka lalmata oo ka hadhay
daahyada teendhada, oo ah daaha badhkiisa, waa in laga
lalmiyaa taambuugga dabadiisa. 13 Dhudhunka oo dhinaca
ah iyo dhudhunka oo dhinaca kale oo ah waxa ka hadha
daahyada teendhada dhererkooda waa in laga lalmiyaa
dhinacyada taambuugga, oo ah dhankan iyo dhankaasba,
inay dedaan. 14 Oo teendhada waa inaad ded uga dhigtaa
wanan hargahood oo la caseeyey, iyo ded ah adhidibadeed
hargahood oo ka sarreeya. 15 Oo looxyada taambuuggu
ku taagan yahay waa inaad qori qudhac ah ka samaysaa.
16 Looxiiba dhererkiisu waa inuu toban dhudhun ahaadaa,
oo loox kasta ballaadhkiisu waa inuu dhudhun iyo badh
ahaadaa. 17 Oo loox kasta waa inuu lahaadaa laba caarad,
oo looxyadu waa inay dhinacyada isku hayaan, oo waa
inaad sidaas u yeeshaa looxyada taambuugga oo dhan. 18
Oo dhinaca koonfureed oo taambuugga looxyadiisa waa
inaad labaatan loox ka dhigtaa. 19 Oo waa inaad samaysaa
afartan saldhig oo lacag ah oo ka hooseeya labaatanka
loox; oo laba saldhigba waa inay ka hooseeyaan loox inay
saldhig u ahaadaan labadiisa caarad, oo laba saldhigna
waa inay ka hooseeyaan loox kale inay saldhig u ahaadaan
labadiisa caarad. 20 Oo taambuugga dhankiisa labaad oo
woqooyi xiga waa inaad u yeeshaa labaatan loox, 21 iyo
afartankoodii saldhig oo lacagta ahayd. Laba saldhigba
waa inay loox ka hoosayso. 22 Oo meesha ugu dambaysa
taambuugga oo ah dhankiisa galbeed waa inaad lix loox

u yeeshaa. 23 Oo laba loox waa inaad u yeeshaa labada
geesood oo taambuugga xaggiisa dambe. 24 Oo waa inay
hoosta labanlaab ka noqdaan, oo sidaas oo kalena waa inay
dhammaadaan ilaa siddada kowaad dusheeda, oo labaduba
waa inay sidaas ahaadaan, oo labada gees baa iska leh. 25
Oo waa inay ahaadaan siddeed loox, iyo saldhigyadoodii
lacagta ahayd oo ah lix iyo toban saldhig, oo laba saldhigba
waa inay loox ka hoosayso. 26 Oo waa inaad ulo gudban
ka samaysa qori qudhac ah; looxyada taambuugga dhinac
kaga jira shan ulood u yeel, 27 looxyada dhinaca kale kaga
jirana shan ulood oo kale u yeel, oo shan ulood oo kale
u yeel taambuugga looxyadiisa kaga jira dhanka galbeed
xaggiisa dambe. 28 Oo uldhexaadda oo looxyada ku gudban
waa inay gaadhaa gees ilaa gees. 29 Oo looxyada waa
inaad dahab ku dahaadhaa, oo siddooyinkooda ah meelaha
ulaha gudban ka gelayaan waxaad ka samaysaa dahab, oo
ulahana waa inaad dahab ku dahaadhaa. 30 Oo taambuugga
waa inaad u taagtaa sidii hannaankii aan buurta kugu tusay.
31 Oo waa inaad ilxidh ka samaysaa buluug, iyo guduud, iyo
casaan, iyo maro wanaagsan; hana lagu daabaco keruubiim.
32 Oo waa inaad ka soo lalmisaa afar tiir oo qudhac ah oo
dahab lagu dahaadhay, iyagoo leh qabsatooyin dahab ah, oo
ku taagan afar saldhig oo lacag ah. 33 Oo waa inaad ilxidhka
ka soo lalmisaa qabsatooyinka hoostooda, oo waxaad soo
gelisaa sanduuqa maragga ilxidhka gudihiisa; oo ilxidhkuna
wuxuu u dhexeeyaa meesha quduuska ah iyo meesha
ugu quduusan idinka aawadiin. 34 Oo daboolka waa inaad
saartaa sanduuqa maragga oo ku jira meesha ugu quduusan.
35 Oo miiskana waa inaad dhigtaa ilxidhka dibaddiisa, oo
laambaddana waxaad dhigtaa miiska hortiisa oo ah dhanka
koonfureed oo taambuugga, miiskana dhanka woqooyi dhig.
36 Oo waa inaad iridda Teendhada u samaysaa daah buluug,
iyo guduud, iyo casaan, iyo maro wanaagsan oo daabac leh.
37 Oo daaha waa inaad u samaysaa shan tiir oo qudhac
ah, oo dahab ku dahaadh iyaga, qabsatooyinkooduna ha
ahaadeen dahab; oo waa inaad shan saldhig oo naxaas ah
u yeeshaa.

**27** Oo meesha allabariga waa inaad ka samaysaa qori
qudhac ah, dhererkeedu shan dhudhun ha ahaado,
ballaadhkeeduna shan dhudhun; oo meesha allabarigu
afar geesood ha ahaado, oo sarajooggeeduna saddex
dhudhun ha ahaado. 2 Oo afarteeda rukun waxaad u
yeeshaa afar gees; oo geesaheedu waa inay isku waslad
la ahaadaan; oo waa inaad naxaas ku dahaadhaa. 3 Oo
waa inaad u samaysaa weelal dambaska lagaga guro, iyo
majarafadaheeda, iyo maddiibadaheeda, iyo mudacyadeeda,
iyo dabqaadayaasheeda, oo alaabteeda oo dhan waxaad ka
samaysaa naxaas. 4 Oo waa inaad shabag naxaas ah u
yeeshaa; oo shabagga dushiisa waa inaad u yeeshaa afar
siddo oo naxaas ah oo ku taal afarta gees. 5 Oo waxaad
hoos dhigtaa qarka ku wareegsan meesha allabariga, inuu
shabaggu gaadho meesha allabariga kalabadhkeeda. 6
Oo meesha allabariga waa inaad u yeeshaa ulo qudhac
ah oo lagu qaado, oo waxaad ku dahaadhaa naxaas. 7
Oo ulaheeda waa in siddooyinka laga geliyaa, oo uluhu
waa inay meesha allabariga labada dhinac kaga jiraan ha
lagu qaadee. 8 Oo waxaad iyada ka samaysaa looxyo,
sida sanduuq madhan oo kale, oo sidii buurta lagugu tusay
ha u sameeyeen. 9 Oo waa inaad samaysaa barxadda
taambuugga; oo barxadda dhinaceeda koonfureed waxaad
ka lalmisaa daah maro wanaagsan ah oo dhererkiisu yahay
boqol dhudhun, 10 oo tiirarkiisuna waa inay ahaadaan
labaatan, iyo labaatan saldhig oo naxaas ah, oo tiirarka
qabsatooyinkooda iyo waxyaalaha laysugu wada xidhaa
waa inay lacag ahaadaan. 11 Oo sidaas oo kale waa inaad
dhinaca woqooyina ka lalmisaa daah ah boqol dhudhun, oo
tiirarkiisuna ha ahaadeen labaatan, iyo labaatan saldhig oo
naxaas ah, oo tiirarka qabsatooyinkooda iyo waxyaalaha
laysugu wada xidhaana lacag ha ahaadeen. 12 Oo barxadda
dhinaca galbeed ballaadhkeeda waxaad ka lalmisaa daah
konton dhudhun ah, oo tiirarkiisu ha ahaadeen toban,
saldhigyadooduna toban. 13 Oo barxadda dhinaca bari
ballaadhkeedu waa inuu konton dhudhun ahaado. 14
Oo iridda dhinaceeda waxaad ka lalmisaa daah shan iyo
toban dhudhun ah; tiirarkiisuna waa inay ahaadaan saddex,
saldhigyadooduna saddex. 15 Oo dhinaca kalena waxaad
ka lalmisaa daah shan iyo toban dhudhun ah, tiirarkiisuna
waa inay ahaadaan saddex, saldhigyadooduna saddex. 16
Oo barxadda iriddeeda waxaad u yeeshaa daah labaatan
dhudhun ah, oo ah buluug, iyo guduud, iyo casaan, iyo
maro wanaagsan oo daabac laga sameeyey, tiirarkiisu
ha ahaadeen afar, saldhigyadooduna afar. 17 Oo tiirarka
barxadda ku wareegsan oo dhan waa in lacag laysugu
wada xidhaa; oo qabsatooyinkooduna waa inay lacag
ahaadaan, saldhigyadooduna waa inay naxaas ahaadaan.
18 Barxadda dhererkeedu waa inuu ahaado boqol dhudhun,
oo ballaadhkeeduna waa inuu meel walba u ahaadaa konton
dhudhun, sarajooggeeduna waa inuu ahaado shan dhudhun,
kana samee maro wanaagsan oo saldhigyadooduna ha
ahaadeen naxaas. 19 Oo alaabta taambuugga lagaga
adeego oo dhan, iyo musmaarradiisa oo dhan, iyo barxadda
musmaarradeeda oo dhammu waa inay naxaas wada
ahaadaan. 20 Oo waxaad reer binu Israa'iil ku amartaa
inay kuu keenaan saliid saafi ah oo saytuun laga tumay

oo laambadda lagu shido, si ay laambaddu had iyo goor u
baxdo. 21 Taambuugga shirka gudihiisa oo ku yaal ilxidhka
dibaddiisa, kuna hor yaalla maragga, fiidka ilaa subaxda waa
inay Haaruun iyo wiilashiisu Rabbiga hortiisa ku diyaariyaan
laambadda; oo wuxuu reer binu Israa'iil u noqon doonaa
qaynuun weligiis u jira ka ab ka ab.

**28** Oo soo kaxayso walaalkaa Haaruun iyo wiilashiisa,
oo kala soo dhex bax reer binu Israa'iil, inuu iiga
adeego hawsha wadaadnimada, kuwaasu waxa weeyaan
Haaruun qudhiisa iyo Naadaab, iyo Abiihuu, iyo Elecaasaar,
iyo Iitaamaar oo wada ah wiilashii Haaruun. 2 Oo walaalkaa
Haaruun waa inaad u samaysaa dhar quduus ah, ammaan
iyo qurux aawadood. 3 Oo waxaad la hadashaa kulli inta
qalbigooda xigmadu ku jirto, oo aan ruuxii xigmadda ka
buuxiyey, inay Haaruun dharkiisa u sameeyaan oo ay isaga
quduus ka dhigaan inuu iiga adeego hawsha wadaadnimada.
4 Oo dharka ay u samaynayaanna waxa weeyaan laabgashi,
iyo eefod, iyo khamiis, iyo jubbad, iyo duub, iyo dhex-xidh, oo
waa inay dhar quduus ah u sameeyaan walaalkaa Haaruun
iyo wiilashiisa, inuu iiga adeego hawsha wadaadnimada. 5
Oo ha qaateen dahab, iyo buluug, iyo guduud, iyo casaan,
iyo maro wanaagsan. 6 Oo eefodka ha ka sameeyeen dahab,
iyo buluug, iyo guduud, iyo casaan, iyo maro wanaagsan,
oo daabacna ha lagu sameeyo. 7 Waa inuu lahaadaa
laba garab oo is-haysta oo ku xidhan labadiisa daraf, inuu
iswada haysto kulligii. 8 Oo dhex-xidhka daabaca leh oo
dusha kaga yaal in lagu xidho waa in isku si loo sameeyaa
oo uu isku waslad la ahaadaa; oo ha ahaado dahab, iyo
buluug, iyo guduud, iyo casaan, iyo maro wanaagsan. 9
Oo waxaad qaadataa laba dhagax oo onika la yidhaahdo,
oo waxaad dushooda ku xaradhaa magacyada reer binu
Israa'iil; 10 magacyadooda lix waa inaad isku dhagax ku
dhigtaa, oo lixda magac oo hadhayna waa inaad dhagaxa
kale ku dhigtaa, siday u kala hor dhasheen. 11 Sida shuqulka
dhagax-xardhihii waa inaad labada dhagax u xaradhaa
xaradh u eg xaradhka shaabadda, oo waana inaad ku
dhigtaa magacyadii reer binu Israa'iil; oo waa inaad saldhigyo
dahab ah ku dhejisaa. 12 Oo labada dhagax waa inaad ku
dhejisaa eefodka garbihiisa inay dhagaxyo xusuus ah u
noqdaan reer binu Israa'iil, oo Haaruun waa inuu Rabbiga
hortiisa magacyadooda ku qaadaa garbihiisa xusuus ahaan
aawadeed. 13 Oo waa inaad u samaysaa saldhigyo dahab
ah, 14 oo waa inaad u samaysaa laba silsiladood oo ah
dahab saafi ah, oo waxaad u samaysaa sida wax xadhko
u eg oo tidcan, oo silsiladaha isku tidcan waa inaad ku
xidhaa saldhigyada. 15 Oo waa inaad samaysaa laabgashi
xukumaadeed, oo daabacna ha lagu sameeyo; oo waa
inaad u samaysaa sida samaynta eefodka; waana inaad ka
samaysaa dahab, iyo buluug, iyo guduud, iyo casaan, iyo
maro wanaagsan. 16 Waa inuu ahaadaa afargeesood oo isku
laalaaban; dhererkiisuna ha ahaado taako, ballaadhkiisuna
ha ahaado taako. 17 Oo waa inaad afar saf oo dhagaxyo
ah ku dul dhejisaa; safka kowaad ha ahaado sardiyos, iyo
tobasiyos, iyo mid birqaya; 18 safka labaadna ha ahaado
sumurud, iyo safayr, iyo dheemman; 19 safka saddexaadna
ha ahaado yakintos, iyo agate, iyo ametustos; 20 safka
afraadna ha ahaado berullos, iyo onika, iyo yasbid; oo waa
in lagu dhejiyo saldhigyo dahab ah. 21 Oo dhagaxyadu waa
inay tiro le'ekaadaan sida magacyada reer binu Israa'iil,
ha ahaadeen laba iyo toban sida magacyadooda, oo laba
iyo tobanka qabiil waa in mid kasta magiciisa lagu xardho
sida xaradhka shaabadda. 22 Oo laabgashiga waxaad ku
samaysaa silsilado xadhko u eg oo laga tidcay dahab saafi
ah. 23 Oo laabgashiga waxaad ku samaysaa laba siddo oo
dahab ah, oo labada siddo waxaad sudhaa laabgashiga
labadiisa darfood. 24 Oo labada silsiladood oo tidcan oo
dahabka ah waxaad ku xidhaa labada siddo oo ku yaal
laabgashiga labadiisa darfood. 25 Oo labada silsiladood oo
tidcan labadooda madax oo kale waxaad ku xidhaa labada
saldhig, oo waxaad ku xidhaa eefodka garbihiisa xaggooda
hore. 26 Oo waxaad samaysaa laba siddo oo dahab ah,
oo waxaad soo sudhaa laabgashiga labadiisa darfood oo
gudaha oo eefodka xiga. 27 Oo waxaad samaysaa laba
siddo oo dahab ah, oo waxaad ku xidhaa eefodka labadiisa
garab xaggooda hoose oo dhanka hore ku yaal, oo ku
dhow meeshay isku xidhmaan, oo ka sarreeya eefodka
dhex-xidhkiisa oo daabaca ah. 28 Oo laabgashiga waa inay
siddooyinkiisa ku xidhaan siddooyinkii eefodka oo ha kula
xidheen shalash buluug ah, inuu ku dul xidnaado dhex-
xidhka daabaca ah oo eefodka, iyo inuusan laabgashigu ka
furnaan eefodka. 29 Oo magacyada reer binu Israa'iil waa in
Haaruun ku qaadaa laabgashiga xukumaadda oo qalbigiisa
saaran markuu galo meesha quduuska ah, inay xusuus
noqdaan Rabbiga hortiisa had iyo goor. 30 Oo laabgashiga
xukumaadda waa inaad gelisaa Uuriimka iyo Tummiimka, oo
waa inay Haaruun qalbigiisa saarnaadaan markuu Rabbiga
hortiisa tago; oo Haaruun waa inuu qalbigiisa ku qaadaa
xukumaadda reer binu Israa'iil had iyo goorba. 31 Oo
khamiiska eefodka kulligiis waa inaad ka dhigtaa buluug. 32
Oo waa inuu meel daloosha oo madaxu maro ku lahaadaa;
oo waa inuu ahaado sida dhar leh tolmo wanaagsan oo
daloolkiisa ku wareegsan inuusan dillaacin aawadeed. 33 Oo
khamiiska daraftiisa hoose waxaad u yeeshaa rummaanno

oo ah buluug, iyo guduud, iyo casaan, oo ku wada wareeji daraftiisa hareeraheeda oo dhan; oo dawanno dahab ahna dhexdooda geli oo ku wareeji. 34 Dawan dahab ah iyo rummaan, haddana dawan dahab ah iyo rummaan, waa inaad ku wareejisaa khamiiska daraftiisa. 35 Oo Haaruun waa inuu gashado inuu ku adeego; oo sanqadhiisana waa la maqli doonaa markuu tago Rabbiga hortiisa oo uu galo meesha quduuska ah, iyo markii uu ka soo baxaba, inuusan dhiman aawadeed. 36 Oo waa inaad samaysaa waslad khafiifa oo dahab saafiya ah, waxaad ku xaradhaa xaradhka u eg xaradhka shaabadda oo leh, WAA U QUDUUS RABBIGA. 37 Oo waa inaad ku xidhaa shalash buluug ah, oo ku dhejisaa duubka, oo duubka intiisa hore ha ku taallo. 38 Oo ha ku taallo Haaruun fooddiisa, Oo Haaruun baa qaadi doona dembiga alaabta quduuska ah, oo ay reer binu Israa'iil quduus kaga dhigi doonaan hadiyadahooda quduuska ah; oo mar kasta waxay ku oolli doontaa fooddiisa, in iyaga laga aqbalo Rabbiga hortiisa. 39 Oo jubbadda marada wanaagsan laga sameeyey waa inaad daabacdaa oo waa inaad duub ka samaysaa maro wanaagsan, oo dhex-xidh waa inaad ka samaysaa daabac. 40 Oo wiilasha Haaruunna waa inaad u samaysaa jubbado iyo dhex-xidho, iyo duubab, iyagu ha u ahaadeen ammaan iyo qurux. 41 Oo waxaad dharkaas u lebbistaa walaalkaa Haaruun iyo wiilashiisa la joogaba; oo waa inaad iyaga subagtaa, oo daahirisaa oo quduus ka dhigtaa, inay iiga adeegaan hawsha wadaadnimada. 42 Oo waa inaad iyaga u samaysaa sirwaallo maro wanaagsan ah oo gaadha dhexdooda ilaa bowdyahooda, oo ay ku qariyaan cawradooda; 43 Haaruun iyo wiilashiisu waa inay gashadaan markay galaan taambuugga shirka ama markay meesha allabariga u dhowaadaan inay ka dhex adeegaan meesha quduuska ah inaanay dembi qaadin oo dhiman. Waxay isaga iyo farcankiisa ka dambeeyaba ku noqon doontaa qaynuun weligiis ah.

**29** Oo waxyaalahan waa waxa aad ku samayso iyaga inaad quduus ka dhigtid inay iiga adeegaan hawsha wadaadnimada; waxaad wadataa dibi yar iyo laba wan oo aan iin lahayn, 2 iyo kibis aan khamiir lahayn, iyo moofo aan khamiir lahayn oo saliid lagu daray, iyo canjeero aan khamiir lahayn oo saliidu marsan tahay, oo waxaad ka samaysaa bur wanaagsan oo sarreen ah. 3 Oo waa inaad isku dambiil ku riddaa oo dambiisha ku keentaa, adigoo wada dibigii iyo labadii wan. 4 Oo Haaruun iyo wiilashiisa waa inaad ilaa iridda teendhada shirka keentaa, oo waa inaad biyo ugu maydhaa. 5 Oo waxaad qaadataa dharkii, oo waxaad Haaruun u gelisaa jubbadda, iyo khamiiska eefodka, iyo eefodka, iyo laabgashiga, oo dhexdana waxaad ugu xidhaa dhex-xidhka daabaca leh oo eefodka; 6 oo duubkana waa inaad madaxiisa saartaa, oo taajka quduuska ahna duubka saar. 7 Oo markaas waxaad qaadataa saliidda lagu subkado, oo madaxiisa ku shub, oo ugu subag isaga. 8 Oo waxaad soo kaxaysaa wiilashiisa oo iyagana jubbado u geli. 9 Oo dhex-xidho ugu xidh, duubabna u duub Haaruun iyo wiilashiisaba; oo qaynuun weligiis ah ayay hawsha wadaadnimada ku lahaan doonaan, oo Haaruun iyo wiilashiisaba waa inaad quduus ka dhigtaa. 10 Oo dibiga waxaad keentaa teendhada shirka horteeda, Haaruun iyo wiilashiisuna gacmaha ha dul saareen dibiga madaxiisa. 11 Oo dibiga waxaad ku qashaa Rabbiga hortiisa xagga iridda teendhada shirka. 12 Oo waxaad qaaddaa dibiga dhiiggiisa, oo fartaada ku mari meesha allabariga geesaheeda; oo dhiigga oo dhan waxaad ku qubtaa meesha allabariga hoosteeda. 13 Oo waxaad qaaddaa xaydha gudaha ku jirta oo dhan, iyo xuubka beerka ku dul yaal, iyo labada kelyood, iyo xaydha dushooda ku taal, oo meesha allabariga ku dul gub. 14 Laakiinse dibiga hilibkiisa iyo haraggiisa iyo uuskiisaba waxaad ku gubtaa xerada dibaddeeda; waayo, waa qurbaan dembi loo bixiyey. 15 Oo haddana waxaad qaaddaa wan; oo Haaruun iyo wiilashiisuna gacmaha ha dul saareen wanka madaxiisa. 16 Oo markaas waa inaad wanka gowracdaa, oo dhiiggiisa intaad qaadatid waxaad ku dul rushaysaa meesha allabariga. 17 Oo markaas waa inaad wanka kala googooysaa, oo waxaad maydhaa uurkujirtiisa iyo lugihiisa, oo meel la dhig googo'iisa iyo madaxiisaba. 18 Oo wanka oo dhan waa inaad ku dul gubtaa meesha allabariga, waayo, waa qurbaan Rabbiga loo gubo; oo waa caraf udgoon oo waa qurbaan dab loogu sameeyo Rabbiga. 19 Oo haddana waxaad qaaddaa wanka kale; oo Haaruun iyo wiilashiisuna gacmaha ha dul saareen wanka madaxiisa. 20 Oo markaas waa inaad wanka gowracdaa, oo dhiiggiisa intaad qaadatid waxaad marisaa dhegta midig oo Haaruun caaraddeeda, iyo dhegta midig oo wiilashiisa caaraddeeda, iyo suulka gacantooda midig, iyo suulka cagtooda midig, oo haddana waxaad dhiigga ku dul rushaysaa meesha allabariga. 21 Oo waxaad qaaddaa dhiigga meesha allabariga ku dul yaal, iyo saliidda lagu subkado, oo waxaad ku rushaysaa Haaruun, iyo dharkiisa, iyo wiilashiisa, iyo dharkii wiilashiisa isaga la jooga; oo waa in quduus laga dhigaa isaga, iyo dharkiisa, iyo wiilashiisa, iyo dharkii wiilashiisa isaga la jooga. 22 Oo waxaad kaloo qaaddaa wanka baruurtiisa, iyo badhidiisa, iyo xaydhiisa gudaha ku duuban, iyo xuubka beerka ku dul yaal, iyo labadiisa kelyood iyo xaydhooda, iyo bowdada midigta ah; waayo, waa wanka quduuskadhigidda.

23 Oo dambiisha hor taal Rabbiga oo ay ku jirto kibista aan
khamiirka lahaynu waxaad kala soo baxdaa xabbad kibis
ah, iyo xabbad ah moofo saliid leh, iyo xabbad canjeero
ah; 24 oo kulligood waxaad saartaa gacmaha Haaruun,
iyo gacmaha wiilashiisa, oo Rabbiga hortiisa ku ruxrux
inay ahaadaan qurbaanka la ruxruxo. 25 Oo markaas waa
inaad gacmahooda ka qaaddid, oo waxaad ku dul gubtaa
qurbaanka la gubo oo meesha allabariga kor yaal, inay caraf
udgoon ku ahaadaan Rabbiga hortiisa. Waa qurbaan dab
loogu sameeyey Rabbiga. 26 Oo waxaad qaaddaa Haaruun
wankiisa quduuskadhigidda sakaarkiisa, oo Rabbiga hortiisa
ku ruxrux sidii qurbaanka la ruxruxo, oo wuxuuna noqon
doonaa qaybtaada. 27 Oo waa inaad quduus ka dhigtaa
sakaarka qurbaanka la ruxruxo, iyo bowdada qurbaanka
sare loo qaado, oo la ruxruxo, oo sarena loo qaado, ee
wanka quduuskadhigidda, xataa qaybta Haaruun iyo qaybta
wiilashiisaba, 28 oo intaas waa inay Haaruun iyo wiilashiisu
amar ahaan uga lahaadaan reer binu Israa'iil weligoodba,
waayo, waa qurbaan sare loo qaado; waana inay ahaato
qurbaan sare loo qaado, oo ay reer binu Israa'iil bixiyaan
markay ku allabaryaan qurbaannadooda nabaadiinada. Waa
qurbaankooda sare loogu qaado Rabbiga. 29 Oo dharka
Haaruun oo quduuska ah waxaa qaadan doona wiilashiisa
isaga dabadiis, si loogu subko oo quduus looga dhigo
iyagoo gashan. 30 Oo wiilka isaga meeshiisa wadaad ka
noqdaa toddoba maalmood waa inuu gashanaadaa markuu
teendhada shirka galo inuu ka adeego meesha quduuska
ah. 31 Oo waa inaad qaaddaa wanka quduuskadhigidda,
oo hilibkiisa waxaad ku karisaa meel quduus ah. 32 Oo
Haaruun iyo wiilashiisu waa inay hilibka wanka iyo kibista ku
jirta dambiisha cunaan xagga iridda taambuugga shirka. 33
Oo waa inay cunaan waxyaalahaas lagu kafaaro guday, inay
daahir iyo quduus ku noqdaan; laakiinse qof qalaadu yaanu
waxba ka cunin, waayo, iyagu waa quduus. 34 Oo haddii
hilibka quduuskadhigidda iyo kibista wax ka hadhaan oo ay
gaadhaan ilaa subaxda, de markaas waa inaad intii hadhay
dab ku gubtaa, oo waa inaan la cunin, maxaa yeelay, waa
quduus. 35 Oo Haaruun iyo wiilashiisa waxaad ku samaysaa
sidii aan kugu amray oo dhan, oo toddoba maalmood
waa inaad iyaga quduus ka dhigtaa. 36 Maalin walba waa
inaad dibiga qurbaanka dembiga u bixisaa kafaaraggud
aawadiis, oo meesha allabarigana waa inaad daahirisaa
markaad u kafaaro gudaysid, oo waa inaad subagtaa inaad
quduus ka dhigtid. 37 Oo toddoba maalmood waa inaad
meesha allabariga u kafaaro guddaa oo quduus ka dhigtaa,
oo meesha allabarigu waa inay ugu wada quduusnaataa,
oo wax kasta oo meesha allabariga taabtaa quduus wuu
noqon doonaa. 38 Haddaba waxanu waa wixii aad meesha
allabariga ku dul bixin lahayd; maalin walba had iyo goor waa
inaad laba wan oo sannad jira ku bixisaa. 39 Wan waa inaad
subaxda bixisaa, wanka kalena waa inaad makhribka bixisaa.
40 Oo bur wanaagsan oo hiin rubuceed oo saliid saafi ah lagu
daray toban meelood oo meel waa inaad wanka la bixisaa,
iyo weliba hiin rubuceed oo khamri ah oo ah qurbaankii
cabniinka. 41 Oo wanka kalena waa inaad makhribka
bixisaa, oo waxaad u bixisaa sida qurbaanka hadhuudhka
ah oo subaxda, iyo qurbaanka cabniinka oo subaxda, caraf
udgoon ha lahaado hana ahaado qurbaan Rabbiga dab
loogu sameeyo. 42 Oo wuxuu ka ab ka ab ahaan doonaa
qurbaan joogto ah oo Rabbiga hortiisa lagu gubo xagga
iridda taambuugga shirka, oo ah meesha aan kugula kulmi
doono inaan kula hadlo aawadeed. 43 Oo halkaas reer binu
Israa'iil ayaan kula kulmi doonaa; oo taambuugguna wuxuu
quduus ku noqon doonaa ammaantayda. 44 Oo waxaan
quduus ka dhigi doonaa taambuugga shirka iyo meesha
allabariga; oo Haaruun iyo wiilashiisana quduus baan ka
dhigi doonaa, inay hawsha wadaadnimada iiga adeegaan.
45 Oo anigu waxaan dhex joogi doonaa reer binu Israa'iil, oo
waxaan ahaan doonaa Ilaahood. 46 Oo iyagu waxay ogaan
doonaan inaan anigu ahay Rabbiga Ilaahood ah oo iyaga
dalkii Masar ka soo bixiyey inaan iyaga dhex joogo. Anigu
waxaan ahay Rabbiga ah Ilaahood.

**30** Oo waxaad samaysaa meel allabari oo foox lagu
shido; waxaadna ka samaysaa qori qudhac ah. 2
Oo dhererkeeduna ha ahaado dhudhun, ballaadhkeeduna
ha ahaado dhudhun, afar geesoodna waa inay
lahaataa, sarajooggeeduna ha ahaado laba dhudhun, oo
geesaheeduna waa inay isku waslad la ahaadaan. 3
Oo waa inaad dahab saafi ah ku dahaadhaa dusheeda
iyo dhinacyadeeda ku wareegsan iyo geesaheedaba; oo
waxaad u samaysaa wax taaj oo kale ah oo dahab ah oo
ku wareegsan. 4 Oo qarkeeda hoostiisa waa inaad laba
siddo oo dahab ah ugu yeeshaa labada rukun; labada
dhinac waa inaad sidaas u yeeshaa, oo waxay u noqon
doonaan meelihii ulaha lagu qaado laga gelin lahaa. 5 Oo
waxaad ulaha ka samaysaa qori qudhac ah, waana inaad
dahab ku dahaadhaa. 6 Oo waxaad hor dhigtaa ilxidhka u
dhow sanduuqa maragga oo hor yaal daboolka ka sarreeya
maragga, halkaas oo ah meesha aan kugula kulmi doono. 7
Oo Haaruun waa inuu ku shido foox udgoon; subax walba
markuu laambadaha hagaajinayo waa inuu foox shido. 8 Oo
makhribka Haaruun markuu laambadaha shidayo waa inuu
foox shido, kaasoo ah foox joogto u ah Rabbiga hortiisa,

ka ab ka ab. 9 Oo waa inaydnaan dusheeda ku bixin foox
qalaad, ama qurbaan la gubo, ama qurbaan hadhuudh ah,
oo dusheedana ha ku daadinina qurbaan cabniin ah. 10
Geesaheedana sannaddiiba mar Haaruun waa inuu ku dul
kafaaro gudo; oo dhiigga allabariga dembiga oo kafaaraggud
ah sannaddiiba mar waa inuu ku kafaaro gudo tan iyo ka ab
ka ab. Waa kan ugu wada quduusan Rabbiga. 11 Markaasuu
Rabbigu Muuse la hadlay, oo wuxuu ku yidhi, 12 Markaad
reer binu Israa'iil tirinaysid, intii ay tiradoodu noqoto oo dhan,
nin waluba waa inuu Rabbiga siiyo madaxfurashadiisa,
markaad tirisid; si aan belaayo ugu dhicin markaad iyaga
tirisid. 13 Oo waxan waa inay bixiyaan, nin walba oo u gudba
kuwa la tiriyey waa inuu bixiyaa nus sheqel le'eg sheqelkii
meesha quduuska ah: (sheqelku waa labaatan geeraah: )
nus sheqel waa in Rabbiga loo bixiyaa. 14 Oo mid kasta oo
u gudba kuwa la tiriyey oo ah inta jirta labaatan sannadood
iyo wixii ka sii weyn, waa inuu bixiyaa Rabbiga wixiisa.
15 Markay Rabbiga wixiisa u bixinayaan inay nafihiinna u
kafaaro gudaan, kii taajir ahu waa inaanu bixin wax nus
sheqel ka badan, kii miskiin ahuna waa inaanu bixin wax
nus sheqel ka yar. 16 Oo waa inaad reer binu Israa'iil
ka qaaddaa lacagta kafaaraggudka ah, oo aad wax kaga
qabataa hawsha taambuugga shirka, inay reer binu Israa'iil
u noqoto xusuus Rabbiga hortiisa, si aad nafihiinna ugu
kafaaro guddaan. 17 Markaasuu Rabbigu Muuse la hadlay
oo wuxuu ku yidhi, 18 Waxaad samaysaa berked weyso oo
naxaas ah, salkeedana waxaad ka samaysaa naxaas, oo
waxaad dhigtaa meel u dhexaysa taambuugga shirka iyo
meesha allabariga; oo waa inaad biyo ku shubtaa, ha lagu
maydho e. 19 Haaruun iyo wiilashiisu waa inay gacmaha iyo
cagaha ku dhaqdaan: 20 oo markay gelayaan taambuugga
shirka waa inay biyo ku maydhaan, yaanay dhimanine, ama
markay meesha allabariga ag yimaadaan inay ka adeegaan
oo ay gubaan qurbaan Rabbiga dab loogu sameeyo, 21 waa
inay gacmaha iyo cagahaba dhaqdaan, yaanay dhimanine;
oo wuxuu iyaga u noqon doonaa qaynuun weligiis ah, xataa
xagga isaga iyo farcankiisa ka dambeeyaba ka ab ka ab. 22
Oo markaasuu haddana Rabbigu Muuse la hadlay oo ku
yidhi, 23 Waxaad qaadataa dhir udgoon oo wacan, oo ah
shan boqol oo sheqel oo ah malmal asli ah, iyo badhkiis oo
qorfe macaan ah, oo ah laba boqol iyo konton sheqel, iyo
laba boqol iyo konton sheqel oo ah kalamus, 24 iyo shan
boqol oo sheqel oo ah kasiya, oo le'eg sheqelka meesha
quduuska ah, iyo hiin muggeed oo saliid saytuun ah. 25 Oo
waxaad ka samaysaa saliid lagu subkado oo quduus ah,
taas oo ah cadar laysku daray sidii kan cadarsameeyaha
oo kale; oo waxay noqon doontaa saliid lagu subkado oo
quduus ah. 26 Oo waxaad ku subagtaa taambuugga shirka
iyo sanduuqa maragga, 27 iyo miiska iyo alaabtiisa oo dhan,
iyo laambadda iyo alaabteeda, iyo meesha allabariga ee
fooxa, 28 iyo meesha allabariga lagu gubo iyo alaabteeda oo
dhan, iyo berkedda weysada iyo salkeedaba. 29 Oo waa
inaad iyaga quduus ka dhigtaa, inay noqdaan kuwa ugu
wada quduusan; oo wax kasta oo iyaga taabtaaba waxay
noqon doonaan quduus. 30 Oo Haaruun iyo wiilashiisaba
waa inaad u subagtaa oo quduus ka dhigtaa, inay iiga
adeegaan hawsha wadaadnimada. 31 Oo waa inaad la
hadashaa reer binu Israa'iil oo waxaad ku tidhaahdaa, Tanu
waxay ka ab ka ab ii noqon doontaa saliid lagu subkado
oo quduus ah. 32 Haddaba waa inaan dad jidhkiisa lagu
shubin, ama waa inaydnaan samayn mid la mid ah, oo
sideeda oo kale loo sameeyey, waayo, iyadu waa quduus,
oo waxay idiin noqon doontaa quduus. 33 Oo ku alla kii
taas oo kale sameeya, ama ku alla kii qof qalaad mariya,
dadkiisa waa laga gooyn doonaa. 34 Markaasaa Rabbigu
wuxuu Muuse ku yidhi, Waxaad qaadataa uunsi udgoon oo
ah istakte iyo onika iyo galbanum, iyagoo ah uunsi ay ku jirto
beeyo saafi ah, oo miisaankooduna ha iswada le'ekaado.
35 Oo waxaad ka samaysaa foox, kaas oo loo sameeyey
sida cadarsameeyuhu uu u sameeyo oo kale, oo cusbo lagu
daray, oo saafi ah, quduusna ah. 36 Oo qaarkiis waa inaad
tuntaa oo yaryaraysaa, oo waxaad hor dhigtaa maragga
ku jira taambuugga shirka, taasoo ah meesha aan kugula
kulmi doono; oo waxay idiin noqon doontaa kan ugu wada
quduusan. 37 Oo fooxa aad samayn doontaan sidiisa ha u
samaysanina; waayo, wuxuu kuu noqon doonaa quduus
Rabbiga aawadiis. 38 Oo ku alla kii kaas oo kale sameeya,
inuu ku udgoonsado, kaas dadkiisa waa laga gooyn doonaa.

**31** Markaasaa Rabbigu Muuse la hadlay, oo wuxuu ku
yidhi, 2 Bal eeg, magac baan ugu yeedhay Besaleel
ina Uurii, oo ah ina Xuur, qabiilkiisuna yahay Yahuudah; 3 oo
waxaan isaga ka buuxiyey Ruuxa Ilaah, xagga xigmadda, iyo
waxgarashada, iyo aqoonta, iyo sancada cayn kasta ah, 4
inuu shuqullo yaab leh hindiso, oo uu ka shaqeeyo dahabka,
iyo lacagta, iyo naxaasta, 5 iyo inuu qoro dhagaxyada
saldhigyo lagu dhejiyo oo uu looxyada xardho, iyo inuu ka
shaqeeyo sanco cayn kasta ah. 6 Oo bal eeg, waxaan
isaga la doortay Aaholii'aab oo ah ina Axiisaamaag, oo
qabiilkiisu yahay Daan; oo inta xigmadda leh oo dhan
waxaan qalbigooda geliyey xigmad, inay sameeyaan wixii
aan kugu amray oo dhan; 7 kuwaasoo ah taambuugga
shirka, iyo sanduuqa maragga, iyo daboolka dul saaran, iyo
alaabta Taambuugga oo dhan, 8 iyo miiska iyo alaabtiisa,

iyo laambadaha saafiga ah, iyo alaabtooda oo dhan, iyo
meesha allabariga oo fooxa, 9 iyo meesha allabariga lagu
gubo, iyo alaabteeda oo dhan, iyo berkedda weysada iyo
salkeeda, 10 iyo dharka adeegidda, iyo dharka quduuska
ah oo wadaadka Haaruun ah, iyo dharka wiilashiisaba,
inay ka adeegaan hawsha wadaadnimada, 11 iyo saliidda
lagu subkado, iyo fooxa uunsiga udgoon ah oo meesha
quduuska ah, oo wax walba sidii aan kugu amray waa inay u
sameeyaan. 12 Markaasaa Rabbigu Muuse la hadlay, oo
wuxuu ku yidhi, 13 Waxaad la hadashaa reer binu Israa'iil, oo
waxaad ku tidhaahdaa, Sida runta ah waa inaad dhawrtaan
ayaamahayga sabtiyaasha ah: waayo, waa calaamo ina dhex
taal aniga iyo idinka ka ab ka ab; si aad u ogaataan inaan
anigu ahay Rabbiga quduus idinka dhigaya. 14 Haddaba
waa inaad dhawrtaan sabtida, waayo, waa idiin quduus, oo
mid kasta oo ka dhiga wax aan quduus ahayn hubaal waa in
la dilaa, waayo, ku alla kii maalintaas shaqeeya, de qofkaas
waa in laga gooyaa dadkiisa. 15 Lix maalmood waa in shuqul
la qabtaa, laakiinse maalinta toddobaad waa sabti nasasho
ah oo Rabbiga quduus u ah; oo ku alla kii maalinta sabtidaa
shuqul qabta hubaal waa in la dilaa. 16 Sidaas daraaddeed
reer binu Israa'iil waa inay sabtida dhawraan, iyagoo ka ab
ka ab sabtida u dhawra axdi weligiis ah aawadiis. 17 Waa
calaamo weligeed ina dhex taal aniga iyo reer binu Israa'iil;
waayo, Rabbigu lix maalmood buu ku sameeyey samada
iyo dhulka, oo maalintii toddobaadna wuu nastay, wuuna
qabowsaday. 18 Oo markii uu dhammeeyey hadalkii uu kula
hadlayay Buur Siinay dusheeda, ayuu Muuse siiyey labadii
loox ee maragga iyagoo ah looxyo dhagaxyo ah, oo fartii
Ilaah lagu qoray.

**32** Oo markii dadkii arkay in Muuse raagay oo uusan
buurtii ka soo degin, ayaa dadkii iyagoo urursan
Haaruun u yimaadeen, oo waxay ku yidhaahdeen, Kac,
oo inoo samee ilaahyo ina hor socda; waayo, Muusahan
oo ah ninkii inaga soo bixiyey dalkii Masar, garan mayno
wax ku dhacay. 2 Markaasaa Haaruun wuxuu iyagii ku
yidhi, Soo bixiya hilqadaha dahabka ah oo dhegaha ugu jira
naagihiinna, iyo wiilashiinna, iyo gabdhihiinna, oo ii keena. 3
Markaasaa dadkii oo dhammu waxay soo bixiyeen hilqadihii
dahabka ahaa oo dhegaha ugu jiray oo waxay u keeneen
Haaruun. 4 Kolkaasuu gacmahooda ka guddoomay, oo
wuxuu ku xardhay alaabta wax lagu xardho, wuxuuna ka
sameeyey weyl dahab la shubay ah; oo waxay yidhaahdeen,
Reer binu Israa'iilow, kanu waa ilaahiinnii dalka Masar
idinka soo waday. 5 Oo Haaruun markuu arkay ayuu meel
allabari ka hor dhisay, markaasaa Haaruun ogeysiis ku
dhawaaqay, oo wuxuu yidhi, Berri waa iiddii Rabbiga. 6
Markaasay subaxdii dambe aroor hore keceen, oo waxay
bixiyeen qurbaanno la gubo, oo waxay keeneen qurbaanno
nabaadiino, markaasay dadkii u fadhiisteen inay wax cunaan
oo wax cabbaan, oo ay u keceen inay cayaaraan. 7
Markaasaa Rabbigu wuxuu Muuse ku yidhi, Kac oo hoos
u deg, waayo, dadkaagii aad dalkii Masar ka soo bixisay,
way iskharribeen, 8 oo haddiiba way ka leexdeen jidkii aan
ku amray, oo waxay samaysteen weyl dahab la shubay
ah, wayna caabudeen, oo allabarina way u bixiyeen, oo
waxayna yidhaahdeen, Reer binu Israa'iilow, kanu waa
ilaahiinnii dalka Masar idinka soo waday. 9 Kolkaasaa
Rabbigu wuxuu Muuse ku yidhi, Anigu dadkan waan arkay
oo waa dad madax adag, 10 haddaba iska kay daa, aan aad
ugu cadhoodee, oo aan kulligood baabbi'iyee, oo waxaan
adiga kaa dhigi doonaa quruun weyn. 11 Markaasaa Muuse
baryay Rabbiga Ilaahiis ah oo wuxuu ku yidhi, Rabbiyow,
maxaad aad ugu cadhoonaysaa dadkaaga aad dalkii Masar
kaga soo bixisay itaal weyn iyo gacan xoog leh? 12 Bal
Masriyiintu maxay u odhan doonaan, Wuxuu iyaga u saaray
xumaan inuu buuraha ku laayo iyo inuu dhulka iyaga ka
baabbi'iyo? Rabbiyow, ka leexo cadhadaada kulul oo ka
noqo xumaantan aad damacsan tahay inaad dadkaaga ku
samaysid. 13 Bal xusuuso addoommadaadii ahaa Ibraahim,
iyo Isxaaq, iyo Israa'iil, oo aad naftaada ugu dhaaratay, oo
aad ku tidhi, Farcankiinna waxaan u badin doonaa sida
xiddigaha cirka, oo dalkan aan ka hadlay oo dhan waxaan
siin doonaa farcankiinna, wayna dhaxli doonaan weligood.
14 Markaasaa Rabbigu ka noqday xumaantii uu damacsanaa
inuu dadkiisa ku sameeyo. 15 Markaasuu Muuse jeestay,
oo buurtii hoos uga degay, isagoo labadii loox oo maragga
ahaa gacanta ku sita, looxyadana wax baa kaga qornaa
labadooda dhinacba; oo dhankan iyo dhankaasba wax
qoran baa kaga yiil. 16 Oo looxyadu waxay ahaayeen
shuqulkii Ilaah, oo farta ku qoranuna waxay ahayd fartii Ilaah
oo looxyada ku xardhan. 17 Oo markii Yashuuca maqlay
qayladii ay dadku ku qaylinayeen ayuu Muuse ku yidhi, War
xeradii qaylo colaadeed baa ka yeedhaysa. 18 Markaasuu
ku yidhi, Kaasu ma aha codka kuwa guulaysta, mana aha
codka kuwa laga adkaado, laakiinse waxaan maqlayaa kuwa
gabyaya codkood. 19 Oo markuu xeradii ku soo dhowaaday
wuxuu arkay weyshii iyo cayaartii; markaasaa Muuse aad u
cadhooday, looxyadiina gacmihiisa wuu ka tuuray, oo wuxuu
ku jejebiyey buurta hoosteedii. 20 Markaasuu weyshii ay
samaysteen qaaday, dab buuna ku gubay oo daqiijiyey, oo
intuu biyaha ku dul daadiyey ayuu reer binu Israa'iil cabsiiyey.
21 Markaasaa Muuse wuxuu Haaruun ku yidhi, War maxaa

dadkanu kugu sameeyey oo aad dembi weyn ugu keentay?
22 Markaasaa Haaruun wuxuu yidhi, Sayidkaygiiyow, bal ha
ii cadhoon; waayo, adiguba waad og tahay inay dadkanu
sharka jecel yihiin. 23 Waayo, waxay igu yidhaahdeen, Inoo
samee ilaahyo ina hor socda, waayo, Muusahan oo ah
ninkii inaga soo bixiyey dalkii Masar, garan mayno wax ku
dhacay. 24 Markaasaan ku idhi, Ku alla kii dahab haystaa,
ha siibo. Kolkaasay i siiyeen, anna dabkaan ku tuuray, oo
waxaa ka soo baxday weyshan. 25 Oo markii Muuse arkay in
dadkii layska sii daayay, waayo, Haaruun baa sii daayay oo
ku kashifay cadaawayaashooda hortooda, 26 ayuu Muuse
istaagay xerada iriddeedii, oo wuxuu yidhi, Ku alla kii Rabbiga
la gees ahow, ii kaalay. Markaasay reer Laawi oo dhammu
agtiisa ku soo urureen. 27 Markaasuu wuxuu iyagii ku yidhi,
Rabbiga ah Ilaaha reer binu Israa'iil sidan buu leeyahay, Nin
waluba seeftiisa dhinaca ha ku xidho, oo kulligiin irid ilaa
irid xerada hore iyo dib u dhex qaada, oo nin waluba ha
dilo walaalkiis, iyo saaxiibkiis, iyo deriskiisaba. 28 Oo reer
Laawi waxay yeeleen hadalkii Muuse, oo maalintaas dadkii
waxaa ka dhintay qiyaastii saddex kun oo nin. 29 Markaasaa
Muuse wuxuu ku yidhi, Inuu maanta barako idinku soo dejiyo
aawadeed, Rabbiga quduus isaga dhiga oo nin waluba ha ka
gees noqdo wiilkiisa iyo walaalkiisba. 30 Oo waxaa dhacday,
in Muuse maalintii dambe dadkii ku yidhi, Idinku dembi
weyn baad samayseen, oo haatan waxaan kor ugu tegayaa
Rabbiga; mindhaa dembigiinna aawadiis ayaan u kafaaro
gudi doonaaye. 31 Markaasaa Muuse wuxuu ku noqday
Rabbiga xaggiisa, oo wuxuu yidhi, Bal dadkanu dembi weyn
bay sameeyeen, oo waxay samaysteen ilaahyo dahab ah.
32 Laakiin hadda haddaad dembigooda cafidid; haddii kalese
waan ku baryayaaye, kitaabkaaga aad qortay iga tir. 33
Markaasaa Rabbigu wuxuu Muuse ku yidhi, Ku alla kii igu
dembaabay weeye kan aan kitaabkayga ka tirayaa. 34 Ee
haddaba tag, oo meeshii aan kaala hadlay dadka u hor kac,
oo bal eeg, malaa'igtayda ayaa ku hor kici doontee; habase
yeeshee maalinta aan soo booqdo ayaan dembigooda u
ciqaabi doonaa. 35 Markaasaa Rabbigu dadkii belaayo ku
riday, waayo, waxay sameeyeen weyshii taasoo tii Haaruun
sameeyey ahayd.

**33** Markaasaa Rabbigu wuxuu Muuse ku yidhi, Tag, oo
halkan ka socda, adiga iyo dadkii aad dalkii Masar ka
soo bixisayba, oo waxaad u kacdaan dalkii aan ugu dhaartay
Ibraahim, iyo Isxaaq, iyo Yacquub, oo aan mid walba ku idhi,
Farcankaagaan siin doonaa. 2 Oo waxaan hortiinna ku soo
diri doonaa malaa'ig, oo waan eryi doonaa reer Kancaan,
iyo reer Amor, iyo reer Xeed, iyo reer Feris, iyo reer Xiwi,
iyo reer Yebuus. 3 U kaca dalkaas caanaha iyo malabka
la barwaaqaysan. Anigu idin dhex socon maayo, waayo,
waaba intaasoo aan jidka idinku baabbi'iyaa, maxaa yeelay,
idinku waxaad tihiin dad madax adag. 4 Oo markii dadkii
warkaas xun maqlay, ayay wada calool xumaadeen, oo
midkoodna ma xidhan wixii uu isku sharrixi jiray. 5 Markaasaa
Rabbigu wuxuu Muuse ku yidhi, Waxaad reer binu Israa'iil
ku tidhaahdaa, Idinku waxaad tihiin dad madax adag, oo
haddii aan daqiiqad qudh ah dhexdiinna imaado, waan idin
baabbi'in; haddaba wixii aad isku sharrixi jirteen, iska fura,
bal inaan ogaado waxaan idinku sameeyo. 6 Markaasaa
reer binu Israa'iil waxay Buur Xoreeb ka bilaabeen inay
iska furaan wixii ay isku sharrixi jireen. 7 Haddaba Muuse
wuxuu qaadi jiray taambuugga oo uu ka dhisi jiray xerada
dibaddeeda, meel xerada ka durugsan; oo wuxuu u bixiyey
Taambuuggii shirka. Oo mid kasta oo Rabbiga doonay,
wuxuu u baxay taambuuggii shirka oo xerada dibaddeeda
ahaa. 8 Oo markii Muuse Taambuuggii u baxay, dadkii oo
dhammu way wada keceen, oo nin waluba teendhadiisa
iriddeeda ayuu istaagay, oo waxay eegayeen Muuse ilaa uu
Taambuuggii galay. 9 Oo markii Muuse Taambuuggii galay
ayaa tiirkii daruurta ahaa soo degay oo Taambuugga iriddiisii
qotonsaday, markaasaa Rabbigu Muuse la hadlay. 10 Oo
dadkii oo dhammuna way wada arkeen tiirkii daruurta ahaa
oo Taambuugga iriddiisii hor qotoma; kolkaasay dadkii oo
dhammu wada kaceen oo Ilaah caabudeen, nin walba oo
teendhadiisa iriddeeda ag jooga. 11 Markaasaa Rabbigu
wuxuu Muuse ula hadlay sida nin saaxiibkiis ula hadlo,
iyagoo iska soo hor jeeda. Kolkaasuu haddana xeradii
ku soo noqday; laakiinse midiidinkiisii ahaa Yashuuca ina
Nuun oo nin dhallinyar ahaa ayaan Taambuuggii ka bixin.
12 Muusena wuxuu Rabbiga ku yidhi, Bal eeg, waxaad i
leedahay, Dadkan kaxee, oo imana aad ogeysiin kan aad
ila diraysid. Laakiin waxaad igu tidhi, Magacaaga waan
kugu aqaan, oo raalli baan kaa ahay. 13 Haddaba waan ku
baryayaaye, haddaad raalli iga tahay, jidadkaaga i tus, inaan
ku ogaado aawadeed, oo aad raalli iga ahaato, oo bal fiiri
in quruuntanu tahay dadkaaga. 14 Markaasuu wuxuu ku
yidhi, Anigu waan kula socon doonaa, oo waan ku nasin
doonaa. 15 Markaasuu isna ku yidhi, Haddaba haddaanad
ila socon, halkan ha naga kaxayn. 16 Waayo, sidee baa lagu
garanayaa inaad raalli naga tahay, aniga iyo dadkaagaba?
Miyaanay ahayn inaad nala socoto si aannu aniga iyo
dadkaaguba uga duwanaanno dadka dhulka jooga oo dhan?
17 Markaasaa Rabbigu wuxuu Muuse ku yidhi, Weliba waxan
aad ku hadashay waan kuu samayn doonaa; waayo, raalli
baan kaa ahay, oo magacaagana waan kugu aqaan. 18

Markaasuu yidhi, Waan ku baryayaaye, ammaantaada i
tus. 19 Isna wuxuu ku yidhi, Wanaaggayga oo dhan ayaan
hortaada soo marin, oo magaca Rabbiga ayaan hortaada
ku naadin, oo waan u roonaan kii aan doonayo inaan u
roonaado, waanan u naxariisan kii aan doonayo inaan u
naxariisto. 20 Oo wuxuu yidhi, Adigu wejigayga arki kari
maysid, waayo, dad i arkaa noolaan maayo. 21 Markaasaa
Rabbigu wuxuu yidhi, Bal eeg, meel baa agtayda ah, oo
waxaad isku taagi doontaa dhagaxa weyn, 22 oo markii ay
ammaantaydu ku ag marayso, waxaan ku gelin doonaa
meel dhagaxa ka dillaacsan, oo gacantaydaan kugu dabooli
doonaa ilaa aan ku dhaafo; 23 oo haddana waan kaa qaadi
doonaa gacantayda, oo waxaad arki doontaa dhabarkayga,
laakiinse wejigayga la arki maayo.

**34** Markaasaa Rabbigu wuxuu Muuse ku yidhi, Waxaad
soo qortaa laba loox oo dhagax ah oo kuwii hore
u eg, oo waxaan looxyada ku qori doonaa erayadii ku
qornaa looxyadii hore, oo aad jebisay. 2 Oo subaxda diyaar
ahow, oo Buur Siinay subaxda soo fuul, oo halkaas buurta
dusheeda ah iigu kaalay. 3 Oo ninna yuusan kula soo
fuulin, oo buurta dhan yaan ninna lagu arkin, oo adhi iyo
lo' toona yaanay buurta horteeda daaqin. 4 Markaasuu
qoray laba loox oo dhagax ah oo kuwii hore u eg; kolkaasuu
Muuse aroor hore kacay, oo Buur Siinay fuulay sidii Rabbigu
ku amray, oo gacantana wuxuu ku qaaday laba loox oo
dhagax ah. 5 Markaasaa Rabbigu daruurtii ku soo degay, oo
halkaas isla taagay, oo wuxuu naadiyey magicii Rabbiga.
6 Kolkaasaa Rabbigu hortiisa maray oo naadiyey isagoo
leh, Waxaan ahay Rabbiga, Rabbiga, oo ah Ilaah raxmad
iyo roonaan badan, oo cadho u gaabiya, oo naxariis iyo
run badan, 7 oo kumankun u naxariista, oo xumaanta
iyo xadgudubka iyo dembiga dhaafa, laakiin aan sinaba u
caddayn in kan dembiga galay aanu eed lahayn; oo xumaantii
awowayaasha soo gaadhsiiya carruurtooda iyo carruurta
carruurtooda tan iyo farcanka saddexaad iyo kan afraadba. 8
Markaasaa Muuse intuu dhaqsaday u sujuuday oo caabuday.
9 Kolkaasuu wuxuu yidhi, Haddaba, Rabbiyow, haddii aad
raalli iga tahay, waan ku baryayaaye, Rabbiyow, bal na dhex
soco oo naga cafi xumaantayada iyo dembigayaga, waayo
dadkanu waa dad madax adag, ee annaga dhaxal ahaan
noo qaado. 10 Markaasuu ku yidhi, Bal eeg, axdi baan
dhigayaa; dadkaaga oo dhan hortiisa waxaan ku samayn
doonaa cajaa'ibyo aan weligood lagu samayn dhulka oo
dhan iyo quruunnaba; oo dadka aad dhex joogto oo dhammu
waxay arki doonaan shuqulka Rabbiga, waayo, waxaan kugu
samaynayaa waa wax cabsi badan. 11 Waxaad dhawrtaa
waxaan maanta kugu amrayo; oo bal ogow, hortaada waxaan
ka eryayaa reer Amor, iyo reer Kancaan, iyo reer Xeed, iyo
reer Feris, iyo reer Xiwi, iyo reer Yebuus. 12 Haddaba iska
jira, oo axdi ha la dhiganina dadka deggan dalka aad u
socotaan, waaba intaasoo ay dabin ku noqoto dhexdiinna,
13 laakiinse waa inaad dumisaan meelahooda allabariga,
oo burburisaan tiirarkooda, oo gooysaan geedahooda
Asheeraah, 14 waayo, idinku waa inaydnaan caabudin ilaah
kale, maxaa yeelay, Rabbiga magiciisu yahay Masayr waa
Ilaah masayr ah; 15 waaba intaasoo aad axdi la dhigataan
dadka dalkaas deggan, oo ay ilaahyadooda raacaan sida
naagi ninkeeda uga dhillowdo, oo ay allabari u bixiyaan
ilaahyadooda, oo inta laydiin yeedho, aad allabarigiisa wax
ka cuntaan, 16 oo waaba intaasoo aad gabdhahooda u
guurisaa wiilashaada, oo ay gabdhahooduna ilaahyadooda
raacaan sida dhillooyin oo kale, oo ay wiilashaadana u jiitaan
inay raacaan ilaahyadooda. 17 Waa inaanad samaysaan
ilaahyo shub ah. 18 Waa inaad dhawrtaan Iiddii Kibista-aan-
khamiirka-lahayn. Oo toddoba maalmood waa inaad cuntaan
kibis aan khamiir lahayn, sidii aan kugu amray wakhtigii la
yidhi ee bishii Aabiib ahayd, maxaa yeelay, bishii Aabiib
ayaad Masar ka soo baxday. 19 Kulli intii maxal furta anigaa
iska leh, iyo kulli xoolahaaga intooda lab oo ah curadyada
dibida iyo wananka oo dhan. 20 Oo dameerka curadka ah
waa inaad wan yar ku furataa, oo haddaanad furanin, de waa
inaad qoorta ka jebisaa. Oo dadkaaga curadyadiisa oo dhan
waa inaad furataa. Oo hortayda midna yuusan iman isagoo
faro madhan. 21 Lix maalmood waa inaad shaqaysaan,
laakiinse maalinta toddobaad waa inaad nasataan; ha
ahaatee xilliga beeraha la falo iyo xilliga beeraha la goostoba
waa inaad maalinta toddobaad nasataan. 22 Oo waa inaad
dhawrtaan Iidda Toddobaadyada, taasoo ah marka la goosto
midhaha ugu horreeya ee sarreenka, iyo Iidda Waxurursiga
ah marka sannadda ugu dambaysa. 23 Sannaddiiba saddex
goor waa inay labkiinna oo dhammu ka hor yimaadaan
Rabbiga Ilaaha ah, Ilaaha reer binu Israa'iil. 24 Waayo, anigu
quruumaan hortiinna ka eryi doonaa, oo soohdimihiinnana
waan ballaadhin doonaa; oo ninnaba dalkiinna ma damci
doono markii aad sannaddiiba saddex goor u baxdaan inaad
Rabbiga Ilaahiinna ah ka hor tagtaan. 25 Waa inaydnaan
dhiigga allabarigayga la bixin kibis khamiir leh, oo waa inaan
allabariga Iidda Kormaridda ilaa subaxda la gaadhsiin. 26
Dhulkiinna midhaha ugu horreeya waa inaad inta hore guriga
Rabbiga Ilaahiinna ah geeysaan. Waa inaydnaan waxar
caanaha hooyadiis ku karin. 27 Markaasaa Rabbigu wuxuu
Muuse ku yidhi, Erayadan qor, waayo, waxaan idinla dhigtay
adiga iyo reer binu Israa'iilba axdi erayadan waafaqsan. 28
Oo halkaasuu Rabbiga la joogay afartan habeen iyo afartan

maalmood, waxbana ma uu cunin, biyona ma uu cabbin. Oo
looxyadiina wuxuu ku qoray erayadii axdiga, kuwaas oo ah
tobanka qaynuun. 29 Oo markii Muuse Buur Siinay ka soo
degay isagoo labadii loox oo maragga gacanta ku sita, intuu
buurta ka soo degayay Muuse ma uu ogayn inuu dubka
wejigiisu la dhalaalayay hadalkii uu kula hadlay aawadiis.
30 Oo markay Haaruun iyo reer binu Israa'iil oo dhammu
Muuse arkeen, bal eeg, dubka wejigiisu waa dhalaalayay,
wayna ka cabsadeen inay u dhowaadaan. 31 Markaasaa
Muuse iyagii u yeedhay; Haaruun iyo taliyayaashii shirka oo
dhammuna way ku soo noqdeen; Muusena wuu la hadlay.
32 Dabadeedna reer binu Israa'iil oo dhammu waa u soo
dhowaadeen. Markaasuu wuxuu iyagii ku amray kulli wixii
Rabbigu isaga ugu sheegay Buur Siinay. 33 Oo markuu
Muuse dhammeeyey hadalkii uu kula hadlayay ayuu indho
shareertay. 34 Laakiinse markii Muuse Rabbiga u galay oo
uu is-hor taagay inuu la hadlo ayuu indhashareertii iska
fayday ilaa uu soo baxay; kolkaasuu soo baxay, oo wuxuu
reer binu Israa'iil u sheegay wixii lagu amray, 35 oo reer
binu Israa'iilna way arkeen Muuse wejigiisii iyo inuu dubka
wejigiisu dhalaalayay, markaasaa Muuse haddana indho
shareertay ilaa uu gudaha u galay inuu la hadlo.

**35** Markaasaa Muuse isu soo ururiyey shirkii reer binu
Israa'iil oo dhan, oo wuxuu ku yidhi, Kuwanu waa
erayadii Rabbigu idinku amray inaad yeeshaan. 2 Lix
maalmood waa in la shaqeeyaa, laakiinse maalinta toddobaad
waa inay maalin quduus ah idiin ahaataa oo waa sabti
nasasho oo Rabbiga loo nasto, oo ku alla kii maalintaas
shuqul qabta waa in nafta laga qaadaa. 3 Oo maalin
kasta oo sabti ah waa inaydnaan innaba dab ku shidin
rugihiinna oo dhan. 4 Oo Muuse wuxuu la hadlay shirkii
reer binu Israa'iil oo dhan, isagoo leh, Waxanu waa wixii
Rabbigu idinku amray, isagoo leh, 5 Idinku dhexdiinna waa
inaad wax Rabbiga isaga ururisaan. Mid kasta oo qalbigiisu
raalli ka yahay, ha keeno qurbaanka Rabbiga, kaasoo ah
dahab, iyo lacag, iyo naxaas, 6 iyo buluug, iyo guduud,
iyo casaan, iyo maro wanaagsan, iyo dhogor riyaad, 7
iyo wanan hargahood oo la caseeyey, iyo adhidibadeed
hargahood, iyo qori qudhac ah, 8 iyo saliid laambadda
lagu shubo, iyo udgoon lagu daro saliidda lagu subkado,
iyo foox udgoon, 9 iyo dhagaxyo onika la yidhaahdo, iyo
dhagaxyo lagu dhejiyo eefodka iyo laabgashiga. 10 Oo nin
kasta oo xigmad leh oo idinku dhex jiraaba ha yimaado
oo ha sameeyo wixii Rabbigu idinku amray oo dhan; 11
waxaas oo ah taambuugga iyo teendhadiisa, iyo dedkiisa,
iyo qabsatooyinkiisa, iyo looxyadiisa, iyo ulihiisa gudban, iyo
tiirarkiisa, iyo saldhigyadiisa, 12 iyo sanduuqa, iyo ulihiisa, iyo
daboolka, iyo ilxidhka daaha ah, 13 iyo miiska, iyo ulihiisa,
iyo alaabtiisa oo dhan, iyo kibista tusniinta, 14 iyo laambadda
iftiinka aawadiis, iyo alaabteeda, iyo laambadaheeda, iyo
saliidda iftiinka aawadiis, 15 iyo meesha allabariga ee fooxa,
iyo ulaheeda, iyo saliidda lagu subkado, iyo fooxa udgoon,
iyo daaha iridda laga soo galo taambuugga, 16 iyo meesha
allabariga lagu gubo, iyo shabaggeeda naxaasta ah, iyo
ulaheeda, iyo alaabteeda oo dhan, iyo berkedda weysada,
iyo salkeeda, 17 iyo barxadda daahyadeeda, iyo tiirarkeeda,
iyo saldhigyadooda, iyo daaha iridda barxadda, 18 iyo
musmaarradii taambuugga, iyo musmaarradii barxadda,
iyo xadhkahooda, 19 iyo dharka lagaga adeegi lahaa
meesha quduuska ah, kuwaas oo ah dharka quduuska ah
ee wadaadka Haaruun, iyo dharka wiilashiisa si ay ugaga
adeegaan hawsha wadaadnimada. 20 Markaasaa shirkii
reer binu Israa'iil oo dhammu waxay ka tageen Muuse
hortiisii. 21 Oo waxay yimaadeen iyagoo mid walba qalbigiisu
kacay, oo mid walba ruuxiisu raalli ka dhigay, oo waxay
keeneen waxay Rabbiga u bixiyeen, kuwaasoo ah wixii
loo doonay shuqulkii teendhada shirka, iyo hawsheeda oo
dhan, iyo dharkii quduuska ahaa. 22 Oo in alla intii raalliga
ahayd way yimaadeen, rag iyo dumarba, oo waxay keeneen
dugaagado, iyo hilqado, iyo kaatunno, iyo murriyado, iyo
wax kasta oo laysku sharxo oo dahab ah; oo nin kastaaba
wuxuu Rabbiga u bixiyey wax dahab ah. 23 Oo nin walba,
oo laga helay buluug, iyo guduud, iyo casaan, iyo maro
wanaagsan, iyo dhogor riyaad, iyo wanan hargahood oo la
caseeyey, iyo adhidibadeed hargahoodba wuu keenay. 24
Oo mid kasta oo qurbaan lacag iyo naxaas ah bixiyey wuxuu
u bixiyey Rabbiga; oo nin kasta oo laga helay qori qudhac
ah wuxuu u keenay hawsha adeegidda aawadeed. 25 Oo
dumarkii xigmadda lahaa oo dhammu waxay gacmahooda
ku miiqeen dun, oo waxay keeneen wixii ay miiqeen oo ahaa
buluug, iyo guduud, iyo casaan, iyo maro wanaagsan. 26
Oo dumarkii qalbigoodu xigmadda la kacay oo dhammu
waxay miiqeen dhogor riyaad. 27 Oo taliyayaashiina waxay
keeneen dhagaxyada onika la yidhaahdo, iyo dhagaxyada
lagu dhejiyo eefodka iyo laabgashiga. 28 Waxayna keeneen
uunsiga, iyo saliidda iftiinka, iyo saliidda lagu subkado, iyo
fooxa udgoon. 29 Oo reer binu Israa'iil waxay Rabbiga u
bixiyeen qurbaan ay raalli ka yihiin; oo waxay ahaayeen dad
rag iyo dumarba leh oo qalbigoodu raalli ka ahaa inay u
keenaan shuqulka Rabbigu Muuse ku amray in la sameeyo
oo dhan. 30 Markaasaa Muuse wuxuu reer binu Israa'iil
ku yidhi, Bal eega, Rabbigu wuxuu magac ugu yeedhay
Besaleel oo ah ina Uurii, oo ah ina Xuur, oo qabiilkiisu yahay

Yahuudah; 31 oo wuxuu isaga ka buuxiyey ruuxii Ilaah, xagga
xigmadda iyo waxgarashada, iyo aqoonta, iyo sancada
caynka kasta ah, 32 iyo inuu shuqullo yaab leh hindiso, oo
uu ka shaqeeyo dahabka, iyo lacagta, iyo naxaasta, 33
iyo inuu qoro dhagaxyo saldhigyo lagu dhejinayo, oo uu
looxyada xardho, iyo inuu ka shaqeeyo sanco cayn kasta
ah. 34 Oo wuxuu qalbigiisii geliyey inuu wax baro, isaga
iyo Aaholii'aab oo ah ina Axiisaamaag, oo qabiilkiisu yahay
Daan. 35 Oo iyaga wuxuu qalbigooda ka buuxiyey xigmad,
inay ka shaqeeyaan shuqul cayn kasta ah oo ay qabtaan
kuwa wax xardha iyo kuwa wax hindisa, iyo kuwa daabac ku
tola buluug, iyo guduud, iyo casaan, iyo maro wanaagsan,
iyo kuwa dharka sameeya, xataa ha ahaatee kuwa shuqul
kasta qabta iyo kuwa shuqullo yaab leh hindisa.

**36**
Oo Besaleel iyo Aaholii'aab iyo nin kasta oo xigmad
leh, oo Rabbigu geliyey xigmad iyo waxgarasho ay ku
gartaan si loo sameeyo shuqul kasta oo ah adeegidda laga
qabanayo meesha quduuska ah, waa inay u qabtaan sidii
Rabbigu ku amray oo dhan. 2 Markaasaa Muuse wuxuu u
yeedhay Besaleel iyo Aaholii'aab, iyo nin kasta oo xigmad
leh, oo Rabbigu qalbigiisa xigmad geliyey, xataa mid kasta
oo qalbigiisu kiciyey inuu yimaado oo shuqulka qabto. 3
Markaasay Muuse ka guddoomeen wixii la bixiyey oo dhan,
oo ay reer binu Israa'iil u keeneen shuqulka adeegidda
meesha quduuska ah, inay ka sameeyaan. Oo haddana
waxay weliba subax walba u keeni jireen waxay raalli
ka yihiin. 4 Oo raggii xigmadda lahaa oo dhan, oo ahaa
kuwii shuqulka ka qabtay meesha quduuska ah, way wada
yimaadeen, oo waxaa nin waluba ka soo kacay shuqulkii
uu samaynayay. 5 Oo intay Muuse la hadleen ayay ku
yidhaahdeen, Dadku waxay keeneen in ka sii badan intii ku
filnayd in lagu qabto shuqulkii Rabbigu amray in la sameeyo.
6 Markaasaa Muuse amar bixiyey, oo waxaa xeradii oo dhan
laga naadiyey inaan nin iyo naag toona wax dambe u bixin
shuqulka meesha quduuska ah. Sidaas daraaddeed baa
dadkii looga joojiyey si aanay wax kale u keenin. 7 Waayo,
alaabtii ay haysteen waa ku filnayd in shuqulka oo dhan
lagu sameeyo, wayna ka sii badnayd weliba. 8 Oo nin kasta
oo xigmad leh oo iyaga ku dhex jiray oo shuqulkii qabtay
wuxuu taambuuggii ka sameeyey toban daah, oo wuxuu
ka sameeyey maro wanaagsan, iyo buluug, iyo guduud,
iyo casaan, oo keruubiim lagu daabacay. 9 Oo daah kasta
dhererkiisu wuxuu ahaa siddeed iyo labaatan dhudhun, oo
daah kasta ballaadhkiisuna wuxuu ahaa afar dhudhun; oo
daahyada oo dhammuna isku wada qiyaas bay ahaayeen.
10 Oo shan daah ayuu mid kasta midka kale ku xidhay, oo
shantii daah oo kalena ayuu mid kasta midka kale ku xidhay.
11 Oo daahyada midkii darafta ugu xigay qarkiisa ayuu wuxuu
u yeelay siddooyin buluug ah; oo sidaasoo kalena wuxuu
u yeelay daahii dibadda ugu xigay intii labaad. 12 Konton
siddo ayuu daahba u yeelay, oo konton siddo oo kalena
wuxuu u yeelay qarkii daaha dibadda u xiga ee intii labaad;
oo siddooyinkuna midba mid buu ku toosnaa. 13 Oo wuxuu
sameeyey konton qabsato oo dahab ah, oo daahyadiina
wuxuu midba midka kale kula lammaaneeyey qabsatooyinkii;
sidaasuu taambuuggu mid u noqday. 14 Markaasuu daahyo
ka sameeyey dhogor riyaad, inay ahaadaan teendho ka
sarrayso taambuugga, oo wuxuu iyaga ka dhigay kow iyo
toban daah. 15 Oo daah kasta dhererkiisu wuxuu ahaa
soddon dhudhun, oo daah kasta ballaadhkiisuna wuxuu ahaa
afar dhudhun; oo kow iyo tobanka daah isku wada qiyaas
bay ahaayeen. 16 Markaasuu shan daah gooni-ahaantooda
isugu xidhay, lix daahna gooni-ahaan. 17 Markaasuu qarkii
daahii dibadda u xigay intii kowaad u yeelay konton siddo, oo
konton siddo oo kalena wuxuu u yeelay qarkii daahii dibadda
u xigay intii labaad. 18 Oo haddana wuxuu sameeyey konton
qabsato oo naxaas ah inuu teendhada iskula dhejiyo oo ay
mid noqoto. 19 Oo teendhadana wuxuu ded uga sameeyey
wanan hargahood oo la caseeyey, iyo ded ah adhidibadeed
hargahood oo ka sarreeya. 20 Oo taambuugga looxyadiisii
taagtaagnaana wuxuu ka sameeyey qori qudhac ah. 21
Oo loox kasta dhererkiisu wuxuu ahaa toban dhudhun,
ballaadhkiisuna wuxuu ahaa dhudhun iyo badh. 22 Oo
loox kastaaba wuxuu lahaa laba caaro, oo looxyaduna
dhinacyaday isku hayeen, oo looxyadii taambuugga oo dhan
sidaasuu u sameeyey. 23 Oo looxyada ayuu Taambuugga
u sameeyey, oo waxay ahaayeen labaatan loox dhinaca
koonfureed. 24 Oo wuxuu sameeyey afartan saldhig oo lacag
ah oo ka hooseeya labaatan loox, oo laba saldhigba waxay
ka hooseeyeen loox, oo waxay saldhig u ahaayeen labadiisii
caaro, oo laba kale oo saldhigna waxay saldhig u ahaayeen
loox kale labadiisii caaro. 25 Oo taambuugga dhankiisa
labaadna oo woqooyi xiga, wuxuu u sameeyey labaatan
loox, 26 iyo afartankoodii saldhig oo lacagta ahayd. Laba
saldhigba loox bay ka hooseeyeen, oo laba saldhig oo kalena
waxay ka hooseeyeen loox kale. 27 Oo taambuugga xaggiisa
dambe oo galbeed xigtana wuxuu u sameeyey lix loox.
28 Oo labada geesood oo taambuugga xaggiisa dambena
wuxuu u sameeyey laba loox. 29 Oo hoosta bay labanlaab
ka noqdeen, oo sidaas oo kalena way dhammaadeen ilaa
siddada kowaad dusheeda, oo sidaasuu ka dhigay labadoodii
ku jiray labada geesood. 30 Waxaana jiray siddeed loox, iyo
saldhigyadoodii lacagta ahaa. Kuwaasu waxay ahaayeen lix
iyo toban saldhig, oo lababa loox ka hoosayso. 31 Oo wuxuu

ulo gudban ka sameeyey qori qudhac ah, oo shan buu u
sameeyey looxyada taambuugga dhinac kaga jira, 32 oo
shan ulood oo kalena wuxuu u sameeyey looxyada dhinaca
kale kaga jira taambuugga, oo shan ulood oo kalena wuxuu
u sameeyey looxyada taambuugga kaga jira xaggiisa dambe
oo galbeed xigta. 33 Oo uldhexaaddii ayuu looxyadii ku
gudbay gees ilaa gees. 34 Oo looxyadii wuxuu ku dahaadhay
dahab, oo siddooyinkoodana wuxuu ka sameeyey dahab
inay ahaadaan meelihii ay ulaha gudban ka geli lahaayeen,
oo ulihiina wuxuu ku dahaadhay dahab. 35 Oo ilxidhkiina
wuxuu ka sameeyey buluug, iyo guduud, iyo casaan, iyo
maro wanaagsan, oo keruubiim buu ku daabacay. 36 Oo
wuxuu u sameeyey afar tiir oo qori qudhac ah, wuxuuna ku
dahaadhay dahab; oo qabsatooyinkooduna waxay ahaayeen
dahab; oo wuxuuna u yeelay afar saldhig oo lacag ah. 37 Oo
iridda Teendhada wuxuu u sameeyey daah ah buluug, iyo
guduud, iyo casaan, iyo maro wanaagsan oo daabac leh. 38
Wuxuuna sameeyey shantiisii tiir iyo qabsatooyinkoodiiba,
oo dahab buu ku dahaadhay tiirarka madaxyadoodii iyo
waxyaalihii laysugu wada xidhayba; oo shantoodii saldhigna
waxay ahaayeen naxaas.

**37** Oo Besaleel wuxuu sanduuqii ka sameeyey qori
qudhac ah, oo dhererkiisuna wuxuu ahaa laba dhudhun
iyo badh, ballaadhkiisuna wuxuu ahaa dhudhun iyo badh,
sarajooggiisuna wuxuu ahaa dhudhun iyo badh. 2 Markaasuu
gudaha iyo dibaddaba kaga dahaadhay dahab saafi ah,
oo wuxuu u yeelay wax taaj oo kale ah oo dahab ah oo
ku wareegsan. 3 Kolkaasuu wuxuu u yeelay afar siddo
oo dahab ah oo afartiisa rukun ee hoose ku yaal; oo laba
siddoba dhinac buu kaga dhejiyey, dhinaca kalena laba
siddo buu kaga dhejiyey. 4 Wuxuuna ulo ka sameeyey
qori qudhac ah, dahab buuna ku dahaadhay. 5 Markaasuu
ulihii wuxuu geliyey siddooyinkii sanduuqa dhinacyadiisa ku
yiil, si sanduuqa loogu qaado. 6 Markaasuu wuxuu dahab
saafi ah ka sameeyey dabool, oo dhererkiisuna wuxuu
ahaa laba dhudhun iyo badh, ballaadhkiisuna wuxuu ahaa
dhudhun iyo badh. 7 Markaasuu laba keruub ka sameeyey
dahab la tumay, oo daboolkii labadiisa madax ayuu ka
taagay. 8 Keruub wuxuu ka sameeyey madax, keruubkii
kalena wuxuu ka sameeyey madaxa kale; oo labada keruub
oo labada madax ka kala taagan iyo daboolkii wuxuu ka
wada sameeyey isku waslad. 9 Oo keruubiimtuna meel
sare ayay baalashooda ka soo kala bixiyeen, oo daboolkay
baalashooda ku qariyeen, wejiyadooduna way iska soo hor
jeedeen; oo keruubiimta wejiyadoodu waxay ku soo jeedeen
daboolka. 10 Miiskana qori qudhac ah ayuu ka sameeyey,
oo dhererkiisu wuxuu ahaa laba dhudhun, ballaadhkiisuna
dhudhun, sarajooggiisuna dhudhun iyo badh, 11 oo wuxuu
ku dahaadhay dahab saafi ah, oo wuxuuna u yeelay wax
taaj oo kale ah oo dahab ah oo ku wareegsan. 12 Oo wuxuu
u yeelay qar le'eg calaacal ballaadhkeed oo ku wareegsan,
oo qarkiina wuxuu u yeelay wax taaj oo kale ah oo dahab
ah oo ku wada wareegsan. 13 Oo wuxuu u yeelay afar
siddo oo dahab ah, oo wuxuu siddooyinkii ku dhejiyey afarta
gees oo afarta rukun oo hoose kaga yiil. 14 Oo siddooyinku
waxay ku dhowaayeen qarka, iyagoo ah meelaha laga
geliyo ulaha miiska lagu qaado. 15 Oo wuxuu ulihii ka
sameeyey qori qudhac ah oo ku dahaadhay dahab, si miiska
loogu qaado. 16 Oo wuxuu dahab saafi ah ka sameeyey
alaabtii miiska saarnayd oo dhan oo ahayd suxuuntiisii,
iyo malqacadihiisii, iyo maddiibadihiisii, iyo kidhliyadiisii
wax laga shubo. 17 Oo wuxuu laambadda ka sameeyey
dahab saafi ah, oo laambaddii waxay ahayd mid tuman,
xataa salkeeda iyo usheeda dhexe iyo koobabkeeda, iyo
burooyinkeeda iyo ubaxeeduba isku waslad bay la wada
ahaayeen. 18 Oo dhinacyadeeda waxaa ka baxayay lix
laamood, oo saddex laamood dhinac bay kaga yiilleen,
saddex laamoodna dhinaca kale ayay kaga yiilleen. 19 Oo
saddex koob oo yicib ubaxeed u eg, iyo buro, iyo ubax baa
isku laan ku yiil, laanta kalena waxaa ku yiil saddex koob oo
yicib ubaxeed u eg, iyo buro, iyo ubax, oo lixdii laamood
oo ka baxday laambaddii sidaasay wada ahaayeen. 20 Oo
laambaddii waxaa ku yiil afar koob oo yicib ubaxeed u eg,
iyo burooyinkoodii iyo ubaxoodii, 21 oo buro waxay ku tiil
laba laamood hoostood, isku waslad bayna la ahayd, buro
kalena waxay ku tiil laba laamood hoostood, isku waslad
bayna la ahayd, burona waxay ku tiil laba laamood hoostood,
isku waslad bayna la ahayd, oo lixda laamoodba sidaasay
wada ahaayeen. 22 Oo burooyinkooda iyo laamahooduba
isku waslad bay la ahaayeen: oo kulligeedna waxay ahayd
isku waslad dahab la tumay oo saafi ah. 23 Oo dahab saafi
ah wuxuu ka sameeyey toddobadeedii laambadood, iyo
birqaabyadeedii iyo alaabteedii lagu safayn jirayba. 24 Oo
iyada iyo alaabteeda oo dhanba wuxuu ka sameeyey talanti
dahab saafi ah. 25 Oo meeshii allabariga ee fooxana wuxuu
ka sameeyey qori qudhac ah, oo dhererkeeduna wuxuu
ahaa dhudhun, ballaadhkeeduna wuxuu ahaa dhudhun,
oo afar geesood bay ahayd, sarajooggeeduna wuxuu
ahaa laba dhudhun, oo geesaheeduna isku waslad bay la
ahaayeen. 26 Oo wuxuu dahab ku dahaadhay dusheedii
iyo dhinacyadeedii ku wareegsanaa, iyo geesaheedii, oo
wuxuu u sameeyey wax taaj oo kale ah oo dahab ah oo ku
wareegsan. 27 Oo qarka hoostiisa laba siddo oo dahab ah

ayuu ugu yeelay labadeeda rukun inay labadeeda dhinac
ugu ahaadaan meelaha ulaha lagu qaado laga gelin lahaa.
28 Oo ulihii wuxuu ka sameeyey qori qudhac ah, dahab
buuna ku dahaadhay. 29 Oo saliiddii quduuska ahayd oo
lagu subkado iyo fooxii saafiga ahaa ee uunsiga udgoon
wuxuu u sameeyey sidii shuqulka cadarsameeyaha oo kale.

**38** Oo meeshii allabariga lagu gubi lahaana wuxuu ka
sameeyey qori qudhac ah, oo dhererkeedu wuxuu
ahaa shan dhudhun, ballaadhkeeduna wuxuu ahaa shan
dhudhun, afargeesood bay ahayd, sarajooggeeduna wuxuu
ahaa saddex dhudhun. 2 Oo geesaheediina wuxuu ugu
sameeyey afarteeda rukun; oo geesaheeduna isku waslad
bay la ahaayeen, naxaas buuna ku dahaadhay. 3 Oo
wuxuu kaloo sameeyey alaabtii meesha allabariga oo dhan,
kuwaasoo ah dheryihii, iyo majarafadihii, iyo maddiibadihii,
iyo mudacyadii, iyo dabqaadayaashii; oo alaabteeda oo dhan
wuxuu ka sameeyey naxaas. 4 Oo wuxuu meeshii allabariga
u sameeyey shabag naxaas ah oo gaadha qarka hoostiisa
ilaa kalabadhka. 5 Afarta daraf oo shabaggii naxaasta ahaa
ayuu u yeelay afar siddo si ay u ahaadaan meelihii ulaha
laga gelin lahaa. 6 Oo ulihiina wuxuu ka sameeyey qori
qudhac ah, naxaas buuna ku dahaadhay. 7 Oo ulihiina
wuxuu ka geliyey siddooyinkii meesha allabariga si loogu
qaado; oo wuxuu meeshii allabariga ka sameeyey looxyo
sida sanduuq madhan oo kale. 8 Oo berkeddii weysada iyo
salkeedii wuxuu ka sameeyey naxaas, taasoo laga helay
muraayadihii dumarka ka adeegi jiray teendhada shirka
iriddeeda. 9 Oo wuxuu sameeyey barxaddii; oo barxadda
xaggeeda koonfureed waxaa ka lushay daahyo dhererkoodu
yahay boqol dhudhun oo ah maro wanaagsan. 10 Oo
tiirarkoodu waxay ahaayeen labaatan, saldhigyadooduna
labaatan, naxaas laga sameeyey; tiirarka qabsatooyinkooda
iyo waxyaalihii laysugu xidhi jirayna waxaa laga sameeyey
lacag. 11 Oo xaggeeda woqooyina waxaa ka lushay daahyo
boqol dhudhun ah, oo tiirarkoodu waxay ahaayeen labaatan,
saldhigyadooduna labaatan, naxaas laga sameeyey; tiirarka
qabsatooyinkooda iyo waxyaalihii laysugu xidhi jirayna
waxaa laga sameeyey lacag. 12 Oo dhinaca galbeed
daahyadiisu waxay ahaayeen konton dhudhun, tiirarkoodu
waxay ahaayeen toban, saldhigyadooduna toban, oo tiirarka
qabsatooyinkooda iyo waxyaalihii laysugu xidhi jirayna waxay
ahaayeen lacag. 13 Oo xagga bari daahyadiisuna waxay
ahaayeen konton dhudhun. 14 Oo iridda daahyadeedu
dhinac waxay ka ahaayeen shan iyo toban dhudhun,
tiirarkooduna saddex bay ahaayeen, saldhigyadooduna
saddex, 15 oo dhinaca kalena sidaas oo kalay ahaayeen,
oo barxadda iriddeeda xaggan iyo xaggaasba waxaa ka
lushay daahyo dhererkoodu yahay shan iyo toban dhudhun,
tiirarkooduna waxay ahaayeen saddex, saldhigyadooduna
saddex. 16 Daahyadii barxadda ku wareegsanaa oo
dhammu waxay ahaayeen maro wanaagsan. 17 Oo tiirarka
saldhigyadoodu waxay ahaayeen naxaas; qabsatooyinkooda
iyo waxyaalihii laysugu xidhi jirayna waxay ahaayeen lacag;
tiirarka madaxyadooda waxaa lagu dahaadhay lacag, oo
tiirarka barxadda oo dhanna waxaa laysugu wada xidhay
lacag. 18 Oo daaha barxadda iriddeeda wuxuu ahaa wax
daabacan oo ah buluug, iyo guduud, iyo casaan, iyo
maro wanaagsan, oo dhererkiisuna wuxuu ahaa labaatan
dhudhun, sarajooggiisuna wuxuu ahaa shan dhudhun oo u
dhigma barxadda daahyadeeda. 19 Tiirarkooduna waxay
ahaayeen afar, saldhigyadoodii naxaasta ahaana afar;
qabsatooyinkooduna waxay ahaayeen lacag, oo tiirarka
madaxyadoodii waxaa ku dahaadhnaa lacag, waxyaalihii
laysugu xidhayna waxay wada ahaayeen lacag. 20 Oo
musmaarrada taambuugga iyo barxadda ku wareegsanba
kulligood waxay ahaayeen naxaas. 21 Waa tan tiradii alaabtii
taambuugga, kaas oo ah taambuuggii maragga, markii la
tiriyey sidii Muuse ku amray adeegidda reer Laawi, oo uu
tilmaamay Iitaamaar kii wadaadkii Haaruun ahaa dhalay. 22
Oo kulli wixii Rabbigu ku amray Muuse waxaa sameeyey
Besaleel oo ahaa ina Uurii oo ahaa ina Xuur, oo qabiilkiisu
ahaa Yahuudah. 23 Oo waxaa isaga la jiray Aaholii'aab oo
ahaa ina Axiisaamaag, oo qabiilkiisu ahaa Daan, oo wuxuu
ahaa mid wax xardha, oo aad iyo aad u farsamo badan,
iyo mid yaqaan sida loo daabaco buluug, iyo guduud, iyo
casaan, iyo maro wanaagsan. 24 Oo dahabkii la bixiyey oo
loogu isticmaalay hawshii meesha quduuskaa oo dhammu
wuxuu ahaa sagaal iyo labaatan talanti, iyo toddoba boqol
iyo soddon sheqel, oo le'eg sheqelka meesha quduuska ah.
25 Oo shirka intiisii la tiriyey lacagtoodii waxay ahayd boqol
talanti, iyo kun iyo toddoba boqol iyo shan iyo toddobaatan
sheqel, oo le'eg sheqelka meesha quduuska ah. 26 Waxaa
nin kastaa bixiyey beqac, kaas oo ah nus sheqel, oo le'eg
sheqelka meesha quduuska ah, oo kulli intii u gudubtay
kuwii la tiriyey, intii jirtay labaatan sanadood iyo wixii ka sii
weyn, waxay ahaayeen lix boqol iyo saddex kun, iyo shan
boqol iyo konton nin. 27 Oo saldhigyada meesha quduuska
ah iyo saldhigyada ilxidhku waxay ka samaysmeen boqolkii
talanti oo lacagta ahaa, boqol saldhig baa laga sameeyey
boqolkii talanti, saldhigba talanti baa laga sameeyey. 28 Kun
iyo toddoba boqol iyo shan iyo toddobaatanka sheqel ayuu
tiirarka qabsatooyinkoodii ka sameeyey, oo wuxuuna ku
dahaadhay tiirarka madaxyadoodii, wuxuuna ka sameeyey

waxyaalihii tiirarka laysugu wada xidhay. 29 Naxaastii la
bixiyey waxay ahayd toddobaatan talanti, iyo laba kun iyo afar
boqol oo sheqel. 30 Oo wuxuu naxaastii ka sameeyey iriddii
teendhada shirka saldhigyadeedii, iyo meeshii naxaasta
ahayd oo allabariga, iyo shabaggeedii naxaasta ahaa, iyo
alaabtii meesha allabariga oo dhan, 31 iyo saldhigyadii
barxadda ku wareegsanaa, iyo saldhigyadii iridda barxadda,
iyo musmaarradii taambuugga oo dhan, iyo musmaarradii
barxadda ku wareegsanaa oo dhan.

39 Oo waxay buluuggii, iyo guduudkii, iyo casaankii
ka sameeyeen dhar aad u wanaagsan in meesha
quduuskaa lagaga adeego, oo waxay kaloo sameeyeen
dharkii quduuska ahaa oo Haaruun, sidii Rabbigu Muuse
ku amray. 2 Oo eefodkiina wuxuu ka sameeyey dahab,
iyo buluug, iyo guduud, iyo casaan, iyo maro wanaagsan.
3 Oo waxay dahabkii u tumeen sidii caleemo khafiif ah
oo kale, markaasay googooyeen oo silig ka dhigeen, in
looga shaqeeyo buluuggii, iyo guduudkii, iyo casaankii,
iyo maradii wanaagsanayd, oo la daabacay. 4 Oo waxay
u sameeyeen garbo is-haystay, oo waxay iska haysteen
labada daraf. 5 Oo dhex-xidhkii daabaca lahaa oo dusha
kaga yiil in lagu xidho, isku waslad buu la ahaa eefodka, isku
sina waa loo sameeyey, waxaana laga sameeyey dahab,
iyo buluug, iyo guduud, iyo casaan, iyo maro wanaagsan,
sidii Rabbigu Muuse ku amray. 6 Oo waxay diyaariyeen
dhagaxyadii onika la odhan jiray, oo ku jira saldhigyo dahab
ah, oo lagu xardhay xaradhkii shaabadda oo ah sida ay
magacyadii reer binu Israa'iil ahaayeen. 7 Oo wuxuu ku
dhejiyey eefodka garbihiisa, inay dhagaxyo xusuus ah u
noqdaan reer binu Israa'iil, sidii Rabbigu Muuse ku amray. 8
Oo wuxuu sameeyey laabgashigii, oo la daabacay, oo u eg
sida samaynta eefodka oo kale, oo ahayd dahab, iyo buluug,
iyo guduud, iyo casaan, iyo maro wanaagsan. 9 Wuxuu
ahaa afargeesood, oo laabgashiga waxay u sameeyeen
labanlaab, oo dhererkiisu wuxuu ahaa taako, ballaadhkiisuna
wuxuu ahaa taako isagoo labanlaaban. 10 Oo waxay ku dul
dhejiyeen afar saf oo dhagaxyo ah; oo safka kowaad wuxuu
ahaa sardiyos, iyo tobasiyos, iyo mid birqaya. 11 Safka
labaadna wuxuu ahaa sumurud, iyo safayr, iyo dheemman.
12 Safka saddexaadna wuxuu ahaa yakintos, iyo agate,
iyo ametustos. 13 Safka afraadna wuxuu ahaa berullos,
iyo onika, iyo yasbid; oo waxaa lagu dhejiyey saldhigyo
dahab ah oo meeshooda ku yaal. 14 Oo dhagaxyaduna
waxay tiro le'ekaayeen magacyadii reer binu Israa'iil, oo
waxay ahaayeen laba iyo toban sidii magacyadoodii; oo
laba iyo tobankii qabiil, mid kasta waxaa magiciisa loogu
xardhay sidii xaradhkii shaabadda. 15 Oo laabgashiga
waxay ku sameeyeen silsilado xadhko u eg, oo laga tidcay
dahab saafi ah. 16 Oo waxay sameeyeen laba saldhig oo
dahab ah, iyo laba siddo oo dahab ah, oo waxay labadii
siddo sudheen laabgashiga labadiisa daraf. 17 Oo labadii
silsiladood oo dahabka ahayd oo tidcanaydna waxay ku
xidheen labadii siddo oo ku yiil darfaha laabgashiga. 18 Oo
labadii silsiladood oo tidcanayd labadoodii madax oo kalena
waxay ku xidheen labadii saldhig, oo waxay ku xidheen
eefodka garbihiisa xaggooda hore. 19 Oo waxay sameeyeen
laba siddo oo dahab ah, oo waxay soo sudheen laabgashiga
labadiisa daraf oo gudaha ah oo eefodka xiga. 20 Oo waxay
kaloo sameeyeen laba siddo oo dahab ah, oo waxay soo
sudheen eefodka garbihiisa xaggooda hoose, oo dhanka
hore ku yaal, oo ku dhow meeshay iskaga xidhmaan, oo ka
sarreeya suunka eefodka dhex-xidhkiisa daabaca ah. 21 Oo
laabgashigii waxay siddooyinkiisii ku xidheen siddooyinkii
eefodka, waxayna kula xidheen shalash buluug ah, inuu
ku dul xidhnaado dhex-xidhka daabaca ah oo eefodka,
iyo inuusan laabgashigu ka debcin eefodka, sidii Rabbigu
Muuse ku amray. 22 Oo khamiiskii eefodkana wuxuu ahaa
dhar samaysan, oo kulligiis buluug ah. 23 Oo daloolkii
khamiiska ku yiil wuxuu ahaa sida daloolka dhar afkiisa rigrig
ku wareegsan yahay, si uusan u dillaacin. 24 Oo khamiiska
darafkiisa hoose waxay ku sameeyeen rummaanno buluug,
iyo guduud, iyo casaan ah, iyo maro wanaagsan. 25 Oo
waxay sameeyeen dawanno dahab saafi ah, oo dawannadii
waxay kala dhex geliyeen rummaannadii ku yiil khamiiska
darafkiisa ku wareegsan, oo u dhexeeya rummaannadii;
26 oo dawan iyo rummaan, haddana dawan iyo rummaan,
ayuu ku wareejiyey khamiiska dharafkiisa, in lagu adeego
aawadeed, sidii Rabbigu Muuse ku amray. 27 Waxay
Haaruun iyo wiilashiisii u sameeyeen jubbadihii marada
wanaagsan ahaa oo si fiican loo sameeyey, 28 oo waxay
kaloo sameeyeen duubkii Haaruun oo marada wanaagsan
ahaa, iyo wiilashiisii duubabkoodii wacanaa oo marada
wanaagsan ahaa, iyo sirwaalladii marada wanaagsan ahaa,
29 iyo dhex-xidhkii ahaa marada wanaagsan, iyo buluug, iyo
guduud, iyo casaan, oo daabacnaa, sidii Rabbigu Muuse
ku amray. 30 Oo waxay kaloo sameeyeen taajkii quduuska
ahaa ee ahaa wasladdii khafiifka oo dahabka saafiga ahayd,
oo waxay dushiisii ku qoreen far u eg xaradhkii shaabadda
oo leh, WAA U QUDUUS RABBIGA. 31 Oo waxay ku
xidheen shalash buluug ah, in lagula dhejiyo duubka sare,
sidii Rabbigu Muuse ku amray. 32 Oo sidaasay hawshii
taambuugga teendhadii shirka oo dhammu ku dhammaatay;
oo reer binu Israa'iil way wada sameeyeen wixii Rabbigu
Muuse ku amray oo dhan, sidii bayna u sameeyeen. 33 Oo

waxay Muuse u keeneen taambuuggii, oo ahaa teendhadii
iyo alaabteedii oo dhan, qabsatooyinkeedii iyo looxyadeedii
iyo ulaheedii gudbanaa, iyo tiirarkeedii, iyo saldhigyadeedii,
**34** iyo dedkii ahaa wananka hargahooda oo la caseeyey, iyo
dedkii ahaa hargaha adhidibadeedka, iyo ilxidhkii daaha
ahaa, **35** iyo sanduuqii maragga, iyo ulihiisii, iyo daboolkii, **36**
iyo miiskii, iyo alaabtiisii oo dhan, iyo kibistii tusniinta, **37** iyo
laambaddii saafiga ahayd, iyo laambadaheedii, kuwaasoo
ah laambadihii la diyaarin lahaa, iyo alaabtoodii oo dhan,
iyo saliiddii lagu shidi lahaa, **38** iyo meeshii allabariga oo
dahabka ahayd, iyo saliiddii lagu subkan lahaa, iyo fooxii
udgoonaa, iyo daahii iridda teendhada, **39** iyo meeshii
allabariga oo naxaasta ahayd, iyo shabaggeedii naxaasta
ahaa, iyo ulaheedii, iyo alaabteedii oo dhan, iyo berkeddii
weysada, iyo salkeedii, **40** iyo barxadda daahyadeedii, iyo
tiirarkeedii, iyo saldhigyadeedii, iyo daahii iridda barxadda, iyo
xadhkihiisii, iyo musmaarradiisii, iyo alaabtii lagu qaban lahaa
hawsha taambuugga oo dhan, teendhada shirka aawadeed,
**41** iyo dharkii loo sameeyey in lagaga adeego meesha
quduuska ah, iyo dharkii quduuska ahaa oo wadaadka
Haaruun ah, iyo dharkii wiilashiisa, ee loogu sameeyey inay
kaga adeegaan hawsha wadaadnimada. **42** Oo kulli wixii
Rabbigu Muuse ku amray oo dhan reer binu Israa'iil sidii bay
hawshii u wada qabteen. **43** Markaasaa Muuse wuxuu arkay
shuqulkii oo dhan, oo bal eeg way wada sameeyeen; sidii
Rabbigu ku amray ayay u sameeyeen; markaasaa Muuse
iyagii u duceeyey.

**40** Markaasaa Rabbigu Muuse la hadlay, oo ku yidhi,
**2** Bisha kowaad maalinteeda kowaad waa inaad
taambuugga teendhada shirka qotomisaa. **3** Oo waa inaad
sanduuqa maragga gudaheeda gelisaa, oo sanduuqa waa
inaad ilxidhka ku qarisaa. **4** Oo miiskana waa inaad
gudaha soo gelisaa, oo aad alaabta saaran hagaajisaa,
oo laambaddana waa inaad gudaha soo gelisaa, oo
laambadaheeda waa inaad shiddaa. **5** Oo meesha allabariga
oo dahabka ah oo fooxa waxaad dhigtaa sanduuqa maragga
hortiisa, oo iridda taambuuggana daaheeda sudh. **6** Oo
meesha allabariga lagu gubona waxaad hor dhigtaa iridda
taambuugga teendhada shirka. **7** Oo berkedda weysadana
waxaad dhigtaa teendhada shirka iyo meesha allabariga
dhexdooda, waana inaad biyo ku shubtaa. **8** Oo waa inaad
dayrka barxadda ku wareegsan qotomisaa, oo barxadda
iriddeedana waxaad soo sudhaa daaha. **9** Oo markaas
waxaad qaadataa saliidda lagu subkado, oo waxaad ku
subagtaa taambuugga, iyo waxa gudihiisa ku jira oo dhan, oo
waa inaad quduus ka dhigtaa isaga iyo alaabtiisa oo dhanba;
oo kolkaasuu quduus noqon doonaa. **10** Oo waxaad kaloo
subagtaa meesha allabariga lagu gubo, iyo alaabteeda oo
dhan, oo meesha allabariga quduus ka dhig, oo markaasay
meesha allabarigu waxay noqon doontaa tan ugu wada
quduusan. **11** Oo waxaad kaloo subagtaa berkedda weysada
iyo salkeeda, oo waa inaad quduus ka dhigtaa. **12** Oo
Haaruun iyo wiilashiisa waxaad keentaa iridda teendhada
shirka, oo waa inaad biyo ugu maydhaa iyaga. **13** Oo
Haaruun waa inaad u gelisaa dharkii quduuska ahaa; oo
waa inaad isaga u subagtaa oo quduus ka dhigtaa, inuu
iiga adeego hawsha wadaadnimada. **14** Oo wiilashiisana
waa inaad keentaa oo jubbado u gelisaa, **15** oo waa inaad
iyana u subagtaa sidii aad aabbahood ugu subagtay oo kale,
inay iiga adeegaan hawsha wadaadnimada, oo subkiddoodu
waxay iyaga u noqon doontaa wadaadnimo iyaga u jiraysa
weligood iyo tan iyo ka ab ka ab. **16** Sidaasuu Muuse yeelay,
oo sidii Rabbigu ku amray oo dhan wuu wada sameeyey.
**17** Oo sannaddii labaad, bisheedii kowaad, maalinteedii
kowaad ayaa taambuuggii la qotomiyey. **18** Oo Muuse
wuxuu qotomiyey taambuuggii, saldhigyadiisiina wuu dhigay,
oo wuxuu taagay looxyadiisii, ulahoodiina wuu ku gudbay,
tiirarkiisiina wuu taagay. **19** Oo taambuuggii buu ku deday
teendhada, oo teendhada dedkeediina wuu ka sii dul mariyey,
sidii Rabbigu Muuse ku amray. **20** Markaasuu qaaday
maraggii oo ku riday sanduuqii, oo ulihiina sanduuqii sudhay,
daboolkiina wuxuu saaray sanduuqa dushiisii; **21** markaasuu
sanduuqiina taambuuggii soo geliyey, oo haddana sudhay
ilxidhkii daaha, oo wuxuu ku qariyey sanduuqii maragga, sidii
Rabbigu Muuse ku amray. **22** Oo miiskiina wuxuu geliyey
teendhadii shirka, oo wuxuu dhigay ilxidhka dibaddiisa oo
ah taambuugga dhankiisa woqooyi. **23** Oo intuu Rabbiga
hor dhigay ayuu kibistii hagaajiyey, sidii Rabbigu Muuse ku
amray. **24** Oo laambaddiina wuxuu geliyey teendhadii shirka,
oo wuxuu dhigay meel miiska ku toosan, oo ah taambuugga
dhankiisa koonfureed. **25** Markaasuu laambadihii Rabbiga
hortiisa ku shiday, sidii Rabbigu Muuse ku amray. **26** Oo
meeshii allabariga oo dahabka ahaydna wuu soo geliyey
teendhadii shirka, oo wuxuu dhigay ilxidhka hortiisa, **27** oo
markaasuu ku shiday foox uunsi udgoon ah, sidii Rabbigu
Muuse ku amray. **28** Oo taambuugga iriddiisiina wuxuu
sudhay daahii. **29** Oo meeshii allabariga lagu gubi jirayna
wuxuu ag dhigay iridda taambuugga ee teendhada shirka,
oo wuxuu dusheeda ku bixiyey qurbaankii la gubayay iyo
qurbaankii hadhuudhka ahaa, sidii Rabbigu Muuse ku amray.
**30** Oo berkeddii weysadana wuxuu dhigay teendhadii shirka
iyo meeshii allabariga dhexdooda, oo wuxuu ku shubay biyo
in lagu maydho. **31** Oo Muuse iyo Haaruun iyo wiilashiisiiba

gacmaha iyo cagaha ayay ku maydheen; **32** oo markay
teendhada shirka galeen iyo markay meesha allabariga
u soo dhowaadeenba way ku maydheen, sidii Rabbigu
Muuse ku amray. **33** Markaasuu qotomiyey dayrkii barxadda
taambuuggii iyo meeshii allabariga ku wareegsanaa, oo
barxadda iriddeediina wuxuu sudhay daahii. Sidaasuu Muuse
shuqulkii u dhammeeyey. **34** Markaasaa daruurtii teendhadii
shirka qarisay, ammaantii Rabbiguna taambuuggay ka
buuxsantay. **35** Oo Muusena inuu teendhadii shirka galo
wuu kari waayay, maxaa yeelay, daruurtii baa dul joogtay,
oo ammaantii Rabbiguna taambuuggay ka buuxday. **36** Oo
markii daruurtii taambuuggii kor ahayd laga qaaday ayaa
reer binu Israa'iil hore u sii wadeen sodcaalladoodii oo dhan,
**37** laakiinse haddii aan daruurtii kor loo qaadin, ma ay socon
jirin ilaa maalinta kor loo qaado. **38** Waayo, daruurtii Rabbigu
maalintii taambuuggay dul joogi jirtay, habeenkiina waxaa
daruurtii ku jiri jiray dab, reer binu Israa'iil oo dhammuna
waxyaalahaas ayay arki jireen sodcaalladoodii oo dhan.

# Laawiyiintii

1 Rabbigu wuxuu Muuse uga yeedhay teendhadii shirka oo intuu la hadlay ayuu ku yidhi, 2 Reer binu Israa'iil la hadal oo waxaad ku tidhaahdaa, Markii nin idinka mid ahu uu Rabbiga qurbaan u bixinayo, qurbaankiinna waxaad ka bixisaan xoolaha, kuwaasoo ah lo'da iyo idaha. 3 Oo haddii qurbaankiisu yahay qurbaan la gubo oo lo' ah, waa inuu bixiyaa neef lab oo aan iin lahayn, oo waa inuu ku bixiyaa teendhada shirka iriddeeda, si isaga Rabbiga hortiisa loogu aqbalo. 4 Oo waa inuu gacanta saaraa madaxa neefka qurbaanka la gubayo, oo waxaa loo aqbali doonaa inuu isaga u ahaado kafaaraggud. 5 Oo dibiga waa inuu Rabbiga hortiisa ku gowraco, oo wiilasha Haaruun oo wadaaddada ahu waa inay dhiigga keenaan, oo ay dhiigga ku dul rusheeyaan hareeraha meesha allabariga ee teendhada shirka horteeda taal. 6 Oo neefka qurbaanka la gubayo waa inuu haragga ka bixiyaa, oo haddana waa inuu xubin xubin u googooyaa. 7 Oo wiilasha Haaruun oo wadaaddada ahu waa inay meesha allabariga dab ku shubaan oo haddana waa inay qoryo ku dul hagaajiyaan dabka, 8 oo markaas wiilasha Haaruun oo wadaaddada ahu xubnaha iyo madaxa iyo baruurta ha ku dul hagaajiyeen qoryaha dabka meesha allabariga saaran, 9 laakiinse neefka uurkujirtiisa iyo addimmadiisa biyo ha ku maydho, oo wadaadku meesha allabariga dusheeda dhammaantiis ha ugu gubo qurbaan la gubo oo ah qurbaan dab lagu sameeyo oo Rabbiga caraf udgoon u ah. 10 Oo haddii qurbaankiisu yahay neef adhi ah, ha ahaado wan ama orgi oo qurbaan la gubo loo keenay, ha bixiyo neef lab oo aan iin lahayn. 11 Oo neefka waa inuu Rabbiga ku hor gowraco meesha allabariga dhinaceeda woqooyi, oo wiilasha Haaruun oo wadaaddada ahu dhiiggiisa ha ku dul rusheeyeen hareeraha meesha allabariga. 12 Oo haddana isagu xubin xubin ha u kala googooyo, iyo madaxiisa iyo baruurtiisa, oo markaas wadaadku waa inuu ku dul hagaajiyo qoryaha dabka meesha allabariga saaran, 13 laakiinse neefka uurkujirtiisa iyo addimmadiisa biyo ha ku maydho, oo wadaadku dhammaantiis ha bixiyo, oo meesha allabariga dusheeda ha ku gubo, waayo, waa qurbaan la gubo oo ah qurbaan dab lagu sameeyo, oo Rabbiga caraf udgoon u ah. 14 Oo haddii qurbaankiisa uu Rabbiga u bixinayo uu yahay haad qurbaan la gubo ah, markaas qurbaankiisa ha u bixiyo qoolleyo ama xamaam yaryar. 15 Oo wadaadku ha keeno meesha allabariga agteeda, oo madaxa ha ka maroojiyo, oo meesha allabariga dusheeda ha ku gubo, oo dhiiggana ha lagaga miiro meesha allabariga agteeda. 16 Oo waa inuu ka soo bixiyaa gulgulada iyo baalasheeda oo ha ku tuuro meesha allabariga dhinaceeda bari, kaasoo ah meeshii dambaska. 17 Oo garbaha ha ka jeexo, laakiinse yuusan kala dillaacin dhammaanteed, oo wadaadku ha ku dul gubo qoryaha dabka meesha allabariga saaran, waayo, waa qurbaan la gubo oo ah qurbaan dab lagu sameeyo, oo Rabbiga caraf udgoon u ah.

2 Oo markii qof qurbaan hadhuudh ah Rabbiga u bixinayo, qurbaankiisu ha ahaado bur, oo waa inuu saliid ku shubaa, oo fooxna saaraa. 2 Oo isagu ha u keeno wadaaddada wiilasha Haaruun ah, oo cantoobo muggeed ha ka qaato burka, iyo saliidda, iyo fooxa oo dhan, oo wadaadku xusuus ahaan meesha allabariga dusheeda ha ugu gubo, waayo, waa qurbaan dab lagu sameeyo oo Rabbiga caraf udgoon u ah. 3 Oo wixii qurbaanka hadhuudhka ah ka hadhana waxaa iska leh Haaruun iyo wiilashiisa; oo waa wax ugu wada quduusan qurbaannada Rabbiga ee dab lagu sameeyo. 4 Oo markaad bixinaysid qurbaan hadhuudh ah oo foorno lagu dubay, ha ahaado moofo aan khamiir lahayn oo laga sameeyo bur saliid lagu daray, ama canjeero aan khamiir lahayn oo saliidu marsan tahay. 5 Oo haddii qurbaankaagu yahay qurbaan hadhuudh ah oo digsi lagu dubay, ha ahaado bur aan khamiir lahayn oo saliid lagu daray. 6 Waa inaad cad cad u kala jejebisid oo aad saliid ku shubtid, waayo, waa qurbaan hadhuudh ah. 7 Oo haddii qurbaankaagu yahay qurbaan hadhuudh ah oo birdaawe lagu dubay, markaas ha laga sameeyo bur saliid lagu daray. 8 Oo qurbaanka hadhuudhka ah oo waxyaalahaas laga sameeyey waa inaad Rabbiga u keentaa, oo waa in wadaadka loo dhiibaa, oo isna meesha allabariga ha keeno. 9 Oo wadaadku qurbaanka hadhuudhka ah waa inuu ka qaadaa intii xusuusta ahayd, oo meesha allabariga dusheeda ha ku gubo, waayo, waa qurbaan dab lagu sameeyo oo Rabbiga caraf udgoon u ah. 10 Oo wixii qurbaanka hadhuudhka ah ka hadho waa in Haaruun iyo wiilashiisu iska lahaadaan, oo waa wax ugu wada quduusan qurbaannada Rabbiga ee dab lagu sameeyo. 11 Qurbaan hadhuudh ah oo aad Rabbiga u bixinaysaan waa inaan khamiir lagu samayn, waayo, waa inaydaan khamiir iyo malab toona sidii qurbaan Rabbiga dab loogu sameeyo u gubin. 12 Iyaga waa inaad Rabbiga ugu bixisaan sidii qurbaan midhaha ugu horreeya ah, laakiinse waa inaan meesha allabariga loogu dul gubin caraf udgoon aawadeed. 13 Oo qurbaan kasta oo ah qurbaankaaga hadhuudhka ah waa inaad cusbaysaa, oo waa inaadan innaba u oggolaan in cusbadii axdiga Ilaahaaga ay ka maqnaato qurbaankaaga hadhuudhka ah. Qurbaannadaada oo dhan waa inaad cusbo la bixisaa. 14 Oo haddaad Rabbiga

u bixinaysid qurbaan hadhuudh ah oo midhaha ugu horreeya
ah, qurbaankaaga hadhuudhka ah oo midhaha ugu horreeya
ah waxaad u bixisaa sabuul qoyan oo la dubay oo la tumay.
15 Oo waa inaad saliid ku shubtaa, fooxna saartaa, waayo,
taasu waa qurbaan hadhuudh ah. 16 Oo wadaadku waa
inuu gubaa intii xusuusta ahayd, oo qaarkeed ha ahaado
hadhuudhka tuman, qaarkeedna ha ahaado saliiddeeda, iyo
fooxeeda oo dhan, waayo, taasu waa qurbaan Rabbiga dab
loogu sameeyo.

3 Oo haddii qurbaankiisu yahay allabari qurbaanno
nabaadiino ah, oo uu lo'da ka bixinayo, lab ama dhaddig
midduu yahayba, waa inuu Rabbiga hortiisa ku bixiyaa neef
aan iin lahayn. 2 Oo waa inuu gacanta saaraa madaxa
neefka qurbaanka ah, oo waa inuu ku ag gowracaa iridda
teendhada shirka, oo wiilasha Haaruun oo wadaaddada ahu
waa inay dhiigga ku dul rusheeyaan hareeraha meesha
allabariga. 3 Oo allabariga qurbaannada nabaadiinada ah
waa inuu Rabbiga qurbaan dab loogu sameeyo uga bixiyaa
xaydha gudaha ku duuban, iyo xaydha neefka uurkiisa ku
jirta oo dhan, 4 iyo labada kelyood iyo xaydha dushooda
ku taal, oo xanjaadka u dhow, iyo xuubka beerka ku dul
yaal, dhammaantood kelyaha ha la qaado. 5 Oo wiilasha
Haaruun waa inay ku dul gubaan meesha allabariga iyo
qurbaanka la gubayo oo kor saaran qoryaha dabka, waayo,
taasu waa qurbaan dab lagu sameeyo oo Rabbiga caraf
udgoon u ah. 6 Oo haddii qurbaankiisu yahay allabari
qurbaanno nabaadiino ah oo uu adhiga ka bixinayo, lab
iyo dhaddig miduu yahayba, waa inuu bixiyaa neef aan iin
lahayn. 7 Oo hadduu qurbaankiisa wan yar ku bixinayo,
Rabbiga hortiisa ha ku bixiyo. 8 Oo waa inuu gacanta saaraa
madaxa neefka qurbaanka ah, oo waa inuu teendhada shirka
horteeda ku gowracaa, oo wiilashii Haaruun waa inay neefka
dhiiggiisa ku dul rusheeyaan hareeraha meesha allabariga.
9 Oo allabariga qurbaannada nabaadiinada ah waa inuu
Rabbiga qurbaan dab loogu sameeyo uga bixiyaa xaydhiisa
iyo badhidiisa oo dhan, taasoo uu ka gooyo meesha ay
lafta dhabarka ka haysato, iyo xaydha gudaha ku duuban,
iyo xaydha neefka uurkiisa ku jirta oo dhan, 10 iyo labada
kelyood, iyo xaydha dushooda ku taal, oo xanjaadka u dhow,
iyo xuubka beerka ku dul yaal, dhammaantood kelyaha
ha la qaado. 11 Oo wadaadku ha ku dul gubo meesha
allabariga, waayo, waxaasu waa cuntadii qurbaanka Rabbiga
dabka loogu sameeyo. 12 Oo haddii qurbaankiisu neef riyo
ah yahayna, Rabbiga hortiisa ha ku bixiyo. 13 Oo waa
inuu gacanta saaraa madaxa neefka, oo teendhada shirka
horteeda waa inuu ku gowracaa, oo wiilasha Haaruunna
neefka dhiiggiisa waa inay ku dul rusheeyaan hareeraha
meesha allabariga. 14 Oo isagu ha bixiyo qurbaankiisii,
kaasoo ah qurbaan Rabbiga dab loogu sameeyo oo ah
xaydha gudaha ku duuban, iyo xaydha neefka uurkiisa ku
jirta oo dhan, 15 iyo labada kelyood, iyo xaydha ku dul
taal oo xanjaadka u dhow, iyo xuubka beerka ku dul yaal,
dhammaantood kelyaha ha la qaado. 16 Oo wadaadku ha ku
dul gubo meesha allabariga, waayo, waxaasu waa cuntadii
qurbaankii dabka loogu sameeyo caraf udgoon. Xaydha
oo dhan Rabbigaa iska leh. 17 Tan iyo ab ka ab waa inuu
qaynuun joogto ah ku ahaadaa meel kastoo aad deggan
tihiinba inaydaan cunin xaydh iyo dhiig midnaba.

4 Markaasaa Rabbigu Muuse la hadlay oo ku yidhi, 2 Dadka
reer binu Israa'iil la hadal, oo waxaad ku tidhaahdaa,
Haddii mid kama' ugu dembaabo waxyaalihii Rabbigu amray
inaan la samayn, oo uu sameeyo waxyaalahaas qaarkood,
3 iyo haddii wadaadka subkanu uu dembaabo oo uu sidaas
dadka dembi ugu keeno, markaas waa inuu dembigiisa uu
dembaabay aawadiis Rabbiga qurbaan dembi ugu bixiyaa
dibi yar oo aan iin lahayn. 4 Oo dibiga waa inuu Rabbiga
ugu hor keenaa iridda teendhada, oo waa inuu gacanta
saaraa madaxa dibiga, oo uu dibiga Rabbiga hortiisa ku
gowracaa. 5 Oo wadaadka subkanu waa inuu dhiigga dibiga
qaarkiis qaadaa oo uu teendhada shirka keenaa, 6 oo
markaas wadaadku fartiisa dhiigga ha geliyo, oo dhiigga
toddoba jeer waa inuu Rabbiga ugu hor saydhaa ilxidhka
meesha quduuska ah. 7 Oo wadaadku waa inuu dhiigga
qaarkiis mariyaa geesaha meesha allabariga ee fooxa oo
Rabbiga hortiisa taal oo teendhada shirka ku dhex taal, oo
dibiga dhiiggiisa oo dhanna waa inuu ku ag shubaa salka
meesha allabariga ee qurbaanka la gubo, taasoo iridda
teendhada shirka taal. 8 Oo dibiga qurbaanka dembiga loo
bixinayo xaydhiisa oo dhan waa inuu ka bixiyaa, waana
xaydha gudaha ku duuban, iyo xaydha neefka uurkiisa
ku jirta oo dhan, 9 iyo labada kelyood, iyo xaydha ku
dul taal, oo xanjaadka u dhow, iyo xuubka beerka ku dul
yaal, dhammaantood kelyaha ha la qaado, 10 sida dibiga
allabariga qurbaannada nabaadiinada ah looga qaado oo
kale, oo wadaadku ha ku dul gubo meesha allabariga ee
qurbaanka la gubo. 11 Oo dibiga haraggiisa iyo hilibkiisa
oo dhan, iyo madaxiisa, iyo addimmadiisa, iyo uurkujirtiisa,
iyo uuskiisa, 12 iyo xataa dibiga oo dhan waa inuu xerada
dibadda uga bixiyaa oo uu geeyaa meel daahirsan, taasoo
ah meesha dambaska lagu soo daadiyo, oo intuu qoryo
saaro waa inuu dab ku gubaa. Meesha dambaska lagu soo
daadiyo waa in lagu gubaa. 13 Oo ururka reer binu Israa'iil oo
dhammu hadduu qaldamo, oo ay waxaasu indhaha shirka ka

qarsoon yihiin, oo ay sameeyaan wax ka mid ah waxyaalihii
uu Rabbigu amray inaan la samayn, oo ay saas eed ku
leeyihiin, **14** dembigii ay dembaabeen markii la ogaado,
shirku waa inuu dibi yar qurbaan dembi u bixiyaa, oo uu
dibiga keenaa teendhada shirka horteeda. **15** Oo odayaasha
ururku waa inay Rabbiga hortiisa gacmahooda ku saaraan
madaxa dibiga, oo dibiga Rabbiga hortiisa ha lagu gowraco.
**16** Oo wadaadka subkanu waa inuu dibiga dhiiggiisa keenaa
teendhada shirka, **17** oo markaas wadaadku fartiisa dhiigga
ha geliyo, oo toddoba jeer waa inuu Rabbiga ugu hor
saydhaa ilxidhka. **18** Oo isagu waa inuu dhiigga qaarkiis
mariyaa geesaha meesha allabariga oo Rabbiga hortiisa taal
oo teendhada shirka ku dhex taal, oo dibiga dhiiggiisa oo
dhanna waa inuu ku ag shubaa salka meesha allabariga ee
qurbaanka la gubo, taasoo iridda teendhada shirka taal.
**19** Oo dibiga xaydhiisa oo dhanna waa inuu ka bixiyaa,
oo meesha allabariga ku dul gubaa. **20** Oo dibiga ha ku
sameeyo siduu ku sameeyey dibigii qurbaanka dembiga oo
kale, oo kanna sidaas oo kale ha ku sameeyo; oo wadaadku
iyaga kafaaraggud ha u sameeyo, oo iyana waa la cafiyi
doonaa. **21** Oo dibiga waa inuu xerada dibadda uga bixiyaa
oo uu gubaa siduu dibigii hore u gubay oo kale, waayo,
kaasu wuxuu shirka u yahay qurbaanka dembiga. **22** Markii
qof madax ahu dembaabo oo uu kama' u sameeyo mid ka
mid ah waxyaalihii Rabbiga Ilaahiisa ahu uu amray inaan la
samayn, oo uu saas eed ku leeyahay, **23** haddii la ogeysiiyo
dembigiisii uu dembaabay, waa inuu qurbaankiisa aawadiis
u keenaa neef riyo ah, waana inuu ahaadaa mid lab oo aan
iin lahayn. **24** Oo waa inuu gacanta saaraa madaxa orgiga,
oo uu ku gowracaa meesha lagu gowraco qurbaanka la
gubo oo Rabbiga hortiisa ah, waayo, kaasu waa qurbaan
dembi. **25** Oo wadaadku waa inuu dhiigga qaarkiis ku
qaadaa fartiisa oo uu mariyaa geesaha meesha allabariga
qurbaanka la gubo, oo dhiiggana waa inuu ku ag shubaa
salka meesha allabariga qurbaanka la gubo. **26** Oo xaydhiisa
oo dhanna waa inuu ku dul gubaa meesha allabariga, sidii
xaydhii allabariga qurbaannada nabaadiinada ah oo kale, oo
wadaadku waa inuu kafaaraggud u sameeyaa dembigiisii,
oo isna waa la cafiyi doonaa. **27** Oo dadka dhulka mid
ka mid ahu hadduu kama' ku dembaabo, oo uu sameeyo
wax ka mid ah waxyaalihii uu Rabbigu amray inaan la
samayn, oo uu saas eed ku leeyahay, **28** haddii la ogeysiiyo
dembigiisii uu dembaabay, waa inuu qurbaankiisa aawadiis
u keenaa neef riyo ah, waana inuu ahaadaa mid dhaddig oo
aan iin lahayn, dembigiisii uu dembaabay aawadiis. **29** Oo
waa inuu gacanta saaraa madaxa neefka ah qurbaanka
dembiga, oo waa inuu neefka ah qurbaanka dembiga ku
gowracaa meesha lagu gowraco qurbaanka la gubo. **30**
Oo wadaadku waa inuu dhiigga qaarkiis fartiisa ku qaadaa
oo uu mariyaa geesaha meesha allabariga qurbaanka la
gubo, oo dhiigga oo dhanna waa inuu ku ag shubaa salka
meesha allabariga. **31** Oo xaydhiisa oo dhanna waa in laga
bixiyaa sidii xaydha looga bixiyo allabarigii qurbaannada
nabaadiinada ah, oo wadaadku waa inuu meesha allabariga
ku dul gubaa, si ay Rabbiga ugu ahaato caraf udgoon; oo
wadaadku waa inuu isaga kafaaraggud u sameeyaa, oo isna
waa la cafiyi doonaa. **32** Oo hadduu neef ido yar ah u keeno
qurbaanka dembigana waa inuu neef dhaddig oo aan iin
lahayn keenaa. **33** Oo waa inuu gacanta saaraa madaxa
neefka qurbaanka dembiga ah, oo waa inuu qurbaanka
dembiga ugu gowracaa meesha lagu gowraco qurbaanka
la gubo. **34** Oo wadaadku waa inuu qurbaanka dembiga
dhiiggiisa qaarkiis fartiisa ku qaadaa oo uu mariyaa geesaha
meesha allabariga qurbaanka la gubo lagu baxsho, oo
dhiigga oo dhanna waa inuu ku ag shubaa salka meesha
allabariga. **35** Oo xaydhiisa oo dhanna waa inuu ka bixiyaa
sidii xaydhii laga qaado wanka yara oo ahaa allabarigii
qurbaannada nabaadiinada ah, oo wadaadku waa inuu ku
dul gubaa meesha allabariga, sidii qurbaannadii Rabbiga
dabka loogu sameeyo, oo wadaadku waa inuu kafaaraggud
u sameeyaa dembigiisii uu dembaabay, oo isna waa la cafiyi
doonaa.

**5** Haddii qof ku dembaabo cod dhaar ah oo uu maqlay,
ee uu isagu marag ka yahay, hadduu arkay iyo hadduu
gartayba, hadduusan sheegin waa inuu dembigiisa qaataa.
**2** Ama haddii qof taabto wax nijaas ah, hadduu yahay
bahal nijaas ah baqtigiis, ama neef xoolo ah oo nijaas ah
baqtigiis, ama waxyaalo gurguurta oo nijaas ah baqtigood,
haddii taasu ay isaga ka qarsoon tahay, oo uu saas ku
nijaasoobo, markaas isagu wuxuu ahaan doonaa mid eed
leh. **3** Ama hadduu taabto qof nijaastiis, nijaasta uu ku
nijaasoobay wax kastoo ay tahayba, haddii taasu ay isaga
ka qarsoon tahay, markuu ogaado wuxuu ahaan doonaa
mid eed leh. **4** Ama haddii mid uu bushimihiisa degdeg
ugaga dhaarto inuu samaynayo xumaan ama samaan, wax
kasta ha ahaadeene wixii qof degdeg ugu dhaarto, hadday
waxaasu isaga ka qarsoon yihiin, markuu waxaas ogaado
wuxuu ahaan doonaa mid waxyaalahan midkood eed ku leh.
**5** Oo markuu ahaado mid waxyaalahan midkood eed ku leh
waa inuu qirtaa wixii uu ku dembaabay, **6** oo markaas waa
inuu dembigii uu dembaabay aawadiis Rabbiga ugu keenaa
qurbaankii xadgudubkiisa, oo waa inuu adhiga ka soo qabto
neef dhaddig ah, oo ah nayl ama waxar oo qurbaan dembi

ah, oo wadaadku waa inuu kafaaraggud uga sameeyaa
dembigiisii. 7 Oo haddii lacagtiisu ayan ugu filnayn inuu neef
baraar ah keeno, markaas dembigii uu dembaabay aawadiis
waa inuu qurbaankii xadgudubkiisa Rabbiga ugu keenaa
laba qoolley ama laba xamaam oo yaryar, oo mid qurbaan
dembi ha ka dhigo, midda kalena qurbaan la gubo. 8 Iyaga
waa inuu wadaadka u keenaa, oo isna marka hore ha bixiyo
tan qurbaanka dembiga ah, oo madaxa ha ka maroojiyo,
laakiinse waa inuusan kala dillaacin. 9 Oo qurbaanka
dembiga dhiiggiisa qaarkiis waa inuu ku rusheeyaa meesha
allabariga dhinaceeda, oo dhiigga intiisa kalena ha lagaga
miiro salka meesha allabariga, waayo, taasu waa qurbaan
dembi. 10 Oo tan labaadna waa inuu qurbaan la gubo ugu
bixiyo si qaynuunka waafaqsan, oo wadaadku waa inuu
kafaaraggud u sameeyaa dembigiisii uu dembaabay, oo isna
waa la cafiyi doonaa. 11 Laakiinse haddii lacagtiisu ayan ugu
filnayn laba qoolley amase laba xamaam oo yaryar, markaas
wixii uu ku dembaabay aawadood qurbaankiisa ha u keeno
eefaah toban meelood loo dhigay meeshiis oo bur ah,
kaasoo qurbaan dembi ah, oo waa inuusan saliid ku shubin,
waana inuusan waxba foox saarin, waayo, waa qurbaan
dembi. 12 Oo waa inuu wadaadka u keenaa, oo wadaadkuna
waa inuu cantoobo muggeed uga qaataa xusuus, oo meesha
allabariga ha ku dul gubo, sidii qurbaannada Rabbiga
dabka loogu sameeyo, waayo, waa qurbaan dembi. 13 Oo
wadaadku waa inuu kafaaraggud u sameeya dembigiisii
uu ku dembaabay wax kasta oo waxyaalahan ka mid ah,
oo isna waa la cafiyi doonaa, oo inta kalena waxaa iska
leh wadaadka, sidii qurbaankii hadhuudhka. 14 Markaasaa
Rabbigu Muuse la hadlay oo wuxuu ku yidhi, 15 Haddii
qof xadgudbo oo uu si kama' ah ugu dembaabo Rabbiga
waxyaalihiisa quduuska ah, markaas waa inuu Rabbiga u
keenaa qurbaankii xadgudubkiisii aawadiis, kaasoo ah wan
aan iin lahayn oo idaha laga soo bixiyey, oo aad ku qiimaysay
lacag intuu sheqel yahay, iyadoo lagu miisaamay sheqelka
meesha quduuska ah, oo kaas qurbaan xadgudub ha u
bixiyo. 16 Oo alaabtii quduuska ahayd oo uu ku dembaabay
waa inuu magdhabaa, oo weliba iyadoo shan meelood loo
dhigay meesheed waa inuu ku daraa, oo waa inuu wadaadka
u dhiibaa, oo wadaadkuna waa inuu isaga kafaaraggud
uga dhigaa wankii ahaa qurbaanka xadgudubka oo isna
waa la cafiyi doonaa. 17 Oo haddii qof dembaabo oo uu
sameeyo wax ka mid ah waxyaalihii uu Rabbigu amray inaan
la samayn, in kastoo uusan ogayn, weli eed buu leeyahay,
oo waa inuu dembigiisa qaataa. 18 Oo isagu waa inuu idaha
ka soo bixiyaa wan aan iin lahayn oo aad adigu qiimaysay,
oo waa inuu wadaadka ugu dhiibaa qurbaan xadgudub, oo
wadaadkuna waa inuu kafaaraggud u sameeyaa wixii uu
kama' ugu qaldamay isagoo aan ogayn, oo isna waa la cafiyi
doonaa. 19 Waa qurbaan xadgudub, maxaa yeelay, sida
xaqiiqada ah isagu Rabbiga hortiisa eed buu ku leeyahay.

6 Markaasaa Rabbigu Muuse la hadlay oo wuxuu ku yidhi,
2 Haddii qof dembaabo oo uu Rabbiga ku xadgudbo,
oo uu si aan daacad ahayn deriskiisa kula macaamiloodo
wax ku saabsan carbuun, ama rahmad, ama dhicid, amase
hadduu deriskiisa dulmo, 3 amase hadduu helo wax lumay
oo uu waxaas qarsado oo uu been ku dhaarto, hadduu
waxyaalahaas midkood sameeyo oo uu saas ku dembaabo,
4 markaas hadduu dembaabay oo uu eedaysan yahay waa
inuu soo celiyaa wixii uu dhacay, ama wixii uu dulmi ku
qaatay, ama carbuunkii isaga loo dhiibtay, ama wixii lumay
oo uu helay, 5 amase wixii uu beenta ugu dhaartay, waa inuu
celiyaa iyagoo kaamil ah, oo weliba waa inuu ku daraa iyada
oo shan meelood loo dhigay meesheed. Oo waa inuu siiyaa
kii waxaas lahaa maalintii la ogaado inuu isagu eedaysan
yahay. 6 Oo isagu qurbaanka xadgudubkiisa aawadiis waa
inuu Rabbiga ugu keenaa wan aan iin lahayn oo uu idaha
ka soo bixiyey ee aad qiimaysay, oo qurbaan xadgudub
aawadiis wadaadka ha ugu keeno. 7 Oo wadaadkuna waa
inuu isaga kafaaraggud ugu sameeyaa Rabbiga hortiisa, oo
isna waa laga cafiyi doonaa wixii uu sameeyey oo uu ku
eedaysan yahay oo dhanba. 8 Markaasaa Rabbigu Muuse
la hadlay oo wuxuu ku yidhi, 9 Haaruun iyo wiilashiisa amar
oo waxaad ku tidhaahdaa, Kanu waa sharciga qurbaanka la
gubo ku saabsan: qurbaanka la gubo waa inuu habeenkii oo
dhan saarnaadaa qoryaha meesha allabariga saaran tan
iyo ilaa waagu ka baryo; oo dabka meesha allabarigana
waa in laga sii ololiyaa. 10 Oo wadaadkuna waa inuu xidhaa
dharkiisa wanaagsan, oo sirwaalkiisa marada wanaagsan
laga sameeyeyna waa inuu gashadaa, oo waa inuu qaadaa
dambaskii qurbaanka la gubayay oo dabku meesha allabariga
dusheeda ku baabba'saday, oo waa inuu meesha allabariga
ku ag shubaa. 11 Oo markaas waa inuu dharkiisii iska
furaa oo uu dhar kale xidhaa, oo dambaska waa inuu meel
daahirsan oo xerada dibaddeeda ah u qaadaa. 12 Oo dabka
meesha allabarigana waa in had iyo goor la sii ololiyaa oo
waa inuusan marna demin; oo wadaadku waa inuu subax
kasta qoryo saaraa, oo uu qurbaanka la gubona ku dul
hagaajiyaa, oo xaydha qurbaanka nabaadiinadana waa inuu
ku dul gubaa. 13 Oo dab joogto ah waa in meesha allabariga
dusheeda laga sii ololiyaa had iyo goorba, oo waa inuusan
marna demin. 14 Oo kanuna waa sharciga qurbaanka
hadhuudhka ku saabsan: Wiilashii Haaruun waa inay ku hor

bixiyaan meesha allabariga ee Rabbiga hortiisa ah. 15 Oo
isagu waa inuu cantoobadiisa muggeed ka qaadaa burka
wanaagsan ee qurbaanka hadhuudhka ah iyo saliiddiisa,
iyo kulli fooxa saaran qurbaanka hadhuudhka oo dhan, oo
waa inuu meesha allabariga ugu dul gubaa caraf udgoon ee
xusuus u ah Rabbiga. 16 Oo wixii qurbaankaas ka hadhayna
Haaruun iyo wiilashiisu ha cuneen. Iyadoo aan khamiir
lahayn waa in meel quduus ah lagu cunaa; oo iyagu waa inay
ku cunaan barxadda teendhada shirka. 17 Waa inaan khamiir
lagu dubin. Anigu taas waxaan iyaga u siiyey qaybtoodii ay
ka heli lahaayeen qurbaannadayda dabka lagu sameeyo.
Iyadu waa ugu quduusan tahay oo waa sidii qurbaankii
dembiga iyo sidii qurbaankii xadgudubka. 18 Oo qof kasta oo
lab ah oo reer Haaruun ka mid ahu waa inuu wax ka cunaa,
oo tan iyo ab ka ab intaasaa looga amray qurbaannada
Rabbiga oo dabka lagu sameeyo; oo ku alla kii taabtaana
quduus buu ahaan doonaa. 19 Markaasaa Rabbigu Muuse la
hadlay oo wuxuu ku yidhi, 20 Kanu waa qurbaanka Haaruun
iyo wiilashiisu ay Rabbiga u bixin doonaan maalintii isaga la
subko, waana eefaah bur ah oo toban meelood loo dhigay
meeshiis, oo ah qurbaan hadhuudh oo joogto ah, oo intaas
badhkeed subaxdii ha la bixiyo, badhka kalena fiidkii ha
la bixiyo. 21 Oo waa in lagu sameeyo digsi oo saliid lagu
sameeyo, oo markii la isku qooshay waa inaad gudaha
soo gelisaa. Xabbad xabbad la dubay waa inaad u bixisaa
qurbaanka hadhuudhka oo Rabbiga caraf udgoon u ah. 22
Oo waxaa bixin doona wadaadka subkan oo reer Haaruun
oo isaga meeshiisa joogi doono, oo qaynuun weligiis ah waa
in dhammaan Rabbiga loogu gubaa. 23 Oo qurbaan kasta oo
hadhuudh ah oo wadaadku bixiyoba waa in dhammaantiis la
wada guba, oo waa inaan la cunin. 24 Markaasaa Rabbigu
Muuse la hadlay oo wuxuu ku yidhi, 25 La hadal Haaruun iyo
wiilashiisa, oo waxaad ku tidhaahdaa, Kanu waa sharciga
ku saabsan qurbaanka dembiga: meesha qurbaanka la
gubo lagu gowraco waa in qurbaanka dembigana lagu
gowracaa Rabbiga hortiisa, waayo, kaasu waa kan ugu wada
quduusan. 26 Oo wadaadka dembiga aawadiis u bixiyaa
waa inuu cunaa, waana in lagu cunaa meel quduus ah oo
ah barxadda teendhada shirka. 27 Oo wax alla wixii hilibkiisa
taabtaana quduus bay ahaan doonaan, oo dhiiggiisana
haddii dhar lagu saydho, wixii uu kaga saydhmay waa
inaad ku maydhaa meel quduus ah. 28 Laakiinse weelka
dhoobada ah oo lagu kariyey waa in la burburiyaa, oo haddii
weel naxaas ah lagu kariyana waa in la xaquuqaa oo biyo
lagu dhaqaa. 29 Oo wadaaddada intooda laboodka ah oo
dhammu waa inay wax ka cunaan, waayo, waa kan ugu
wada quduusan. 30 Oo qurbaankii dembiga oo dhiiggiisa
la soo geliyo teendhada shirka si meesha quduuska ah
kafaaraggud loogu sameeyo innaba waa inaan la cunin,
waase in dab lagu gubaa.

7 Oo kanuna waa sharciga ku saabsan qurbaanka
xadgudubka. Kaasu waa kan ugu wada quduusan. 2
Meesha qurbaanka la gubo lagu gowraco waa in qurbaanka
xadgudubkana lagu gowracaa, oo dhiiggiisana waa inuu ku
dul rusheeyaa hareeraha meesha allabariga. 3 Oo isagu
waa inuu bixiyaa baruurta taasoo ah badhida, iyo xaydha
gudaha ku duuban, 4 iyo labada kelyood iyo xaydha ku dul
taal oo xanjaadka u dhow, iyo xuubka beerka ku dul yaal,
waa inuu kelyaha la qaadaa. 5 Oo wadaadku waa inuu
meesha allabariga ugu dul gubaa qurbaan Rabbiga dab
loogu sameeyo, waayo, kaasu waa qurbaankii xadgudubka.
6 Oo wadaaddada intooda laboodka ah oo dhammu waa
inay wax ka cunaan, oo waa in lagu cunaa meel quduus
ah, waayo, kaasu waa kan ugu wada quduusan. 7 Oo
qurbaanka xadgudubku waa sidii qurbaanka dembiga oo
kale. Oo iyagu isku sharci ayay leeyihiin, oo wadaadkii
kafaaraggudka ku sameeyaa ha lahaado. 8 Oo wadaadkii qof
qurbaan la gubo u bixiyaa ha iska qaato haragga qurbaanka
la gubo oo uu bixiyey. 9 Oo qurbaan kasta oo hadhuudh
ah oo foorno lagu dubo, iyo wax alla wixii birdaawe ama
digsi lagu sameeyo waxaa iska leh wadaadka bixiya. 10
Oo qurbaan kasta oo hadhuudh ah oo saliid lagu daray
amase engeg ah waa inay wiilasha Haaruun oo dhammu
lahaadaan, oo sidii mid u cuno kan kalena ha u cuno. 11 Oo
kanuna waa sharciga ku saabsan allabariga qurbaannada
nabaadiinada ah oo Rabbiga loo bixiyo. 12 Oo hadduu
mahadnaqid aawadeed u bixinayo, waa inuu allabariga
mahadnaqidda la bixiyaa moofo aan khamiir lahayn oo
saliid lagu daray, iyo canjeero aan khamiir lahayn oo saliidu
marsan tahay, iyo moofo saliid lagu daray oo bur la qoyay
laga sameeyey. 13 Kibis khamiir leh waa inuu la bixiyaa
qurbaankiisa iyo allabariga qurbaannadiisa nabaadiinada
ah mahadnaqid aawadeed. 14 Oo qurbaan kastana waa
inuu ka bixiyaa xabbad ah qurbaanka sare loo qaado oo
Rabbiga loo bixiyo, oo waxaa iska lahaanaya wadaadka
saydhsaydha dhiigga qurbaannada nabaadiinada. 15 Oo
hilibka allabarigiisa qurbaannadiisa nabaadiinada ah oo
uu mahadnaqidda u bixiyo waa in dhammaantiis la cunaa
maalinta uu qurbaankiisa bixiyo, oo waa inuusan waxba
ka gaadhsiin tan iyo subaxda dambe. 16 Laakiinse haddii
allabariga qurbaankiisu uu yahay nidar amase qurbaan
uu ikhtiyaar u bixiyo, waa in la cunaa maalinta uu bixiyo
allabarigiisa, oo wixii ka hadhana maalinta ku xigta ha la

cuno. 17 Laakiinse hilibka allabariga wixii ka hadha oo
maalinta saddexaad gaadha waa in dab lagu gubaa. 18 Oo
haddii hilibka allabarigiisa qurbaannada nabaadiinada ah la
cuno maalinta saddexaad, markaas la aqbali maayo, oo kii
bixiyeyna loo xisaabi maayo, laakiin taasu waxay ahaan
doontaa karaahiyo, oo qofkii cunaana isagaa dembigiisa
qaadanaya. 19 Oo hilibkii taabta wax nijaas ahna waa
inaan la cunin; waase in dab lagu gubaa. Oo hilibkana
qof kasta oo daahir ahu wax ha ka cuno. 20 Laakiinse
hilibka allabariga qurbaannada nabaadiinada ah oo Rabbigu
iska leeyahay qofkii cuna isagoo nijaastiisii ku taal waa in
dadkiisii laga gooyaa. 21 Oo qof hadduu taabto wax nijaas
ah, hadday tahay qof nijaastiis ama bahal nijaas ah amase
karaahiyo nijaas ah, oo uu wax ka cuno hilibka allabariga
qurbaannada nabaadiinada ah oo Rabbigu iska leeyahay,
qofkaas waa in dadkiisa laga gooyaa. 22 Markaasaa Rabbigu
Muuse la hadlay oo wuxuu ku yidhi, 23 Reer binu Israa'iil
la hadal oo waxaad ku tidhaahdaa, Idinku waa inaydaan
cunin baruur lo'aad ama mid idaad amase mid riyood. 24 Oo
neefkii iska dhinta baruurtiisa iyo neefkii dugaaggu bakhtiisto
baruurtiisa toona waa inaydaan sinaba u cunin, laakiinse
siyaalo kale waa loogu isticmaali karaa. 25 Waayo, qofkii
cuna baruurtii neefka dadku u bixiyo qurbaan dab loogu
sameeyo Rabbiga, qofka kaas cuna waa in dadkiisa laga
gooyaa. 26 Oo waa inaydaan degmooyinkiinna oo dhan ku
dhex cunin dhiig cayn kasta ha ahaadee, hadduu yahay mid
haad ama mid xayawaan toona. 27 Ku kasta ha ahaadee
qofkii dhiig cuna waa in dadkiisa laga gooyaa. 28 Markaasaa
Rabbigu Muuse la hadlay oo wuxuu ku yidhi, 29 Reer binu
Israa'iil la hadal oo waxaad ku tidhaahdaa, Kii Rabbiga u
bixiyaa allabarigiisa qurbaannada nabaadiinada ah waa inuu
Rabbiga qurbaankiisa uga keenaa allabariga qurbaannadiisa
nabaadiinada ah. 30 Waa inuu gacmihiisa ku keenaa
qurbaannada Rabbiga oo dabka lagu sameeyo; waa inuu
keenaa baruurta iyo sakaarka in sakaarka Rabbiga hortiisa
lagu ruxruxo sidii qurbaanka la ruxruxo. 31 Oo wadaadku
waa inuu baruurta ku dul gubaa meesha allabariga, laakiinse
sakaarka waxaa iska leh Haaruun iyo wiilashiisa. 32 Oo
allabariga ah qurbaannadiinna nabaadiinada waxaad ka soo
bixisaan bowdada midig oo waa inaad wadaadka siisaan, ha
ahaatee qurbaan sare loo qaado. 33 Kii reer Haaruun ka
mid ah oo bixiya dhiigga qurbaannada nabaadiinada iyo
baruurta ayaa qayb ahaan u leh bowdada midig. 34 Waayo,
anigu reer binu Israa'iil ayaan allabariga ah qurbaannadooda
nabaadiinada kala baxay sakaarka la ruxruxo iyo bowdada
sare loo qaado, oo waxaan reer binu Israa'iil amar kaga siiyey
wadaadka Haaruun iyo wiilashiisa weligoodba. 35 Taasu
waa qaybtii subkidda oo Haaruun iyo qaybtii subkidda oo
wiilashiisa oo la kala baxayo qurbaannada Rabbiga oo dabka
lagu sameeyo, maalintii iyaga loo keenay Rabbiga inay
isaga uga adeegaan jagada wadaadnimada, 36 kuwaasoo
maalintii la subkay uu Rabbigu amray in reer binu Israa'iil
iyaga siiyaan, oo taasna ab ka ab baa loo amray. 37
Haddaba kanu waa sharciga ku saabsan qurbaanka la gubo,
iyo qurbaanka hadhuudhka, iyo qurbaanka dembiga, iyo
qurbaanka xadgudubka, iyo kan quduuskadhigidda, iyo kan
allabariga qurbaannada nabaadiinada ah, 38 ee uu Rabbigu
Muuse kaga amray Buur Siinay maalintii uu reer binu Israa'iil
ku amray inay Rabbiga u bixiyaan qurbaannadooda iyagoo
jooga cidladii Siinay.

8 Markaasaa Rabbigu Muuse la hadlay oo wuxuu ku yidhi,
2 Waxaad keentaa Haaruun iyo wiilashiisa oo isaga la
jira, iyo dharka, iyo saliidda lagu subkado, iyo dibiga ah
qurbaanka dembiga, iyo labada wan, iyo dambiisha ay
kibista aan khamiirka lahaynu ku jirto. 3 Oo ururka oo
dhanna waxaad ku soo shirisaa iridda teendhada shirka. 4
Oo Muusena waa yeelay wixii Rabbigu isaga ku amray, oo
ururkiina waa lagu soo shiriyey iridda teendhadii shirka. 5
Kolkaasaa Muuse ururkii oo dhan ku yidhi, Waxanu waa
waxa Rabbigu amray in la sameeyo. 6 Markaasaa Muuse
wuxuu soo kexeeyey Haaruun iyo wiilashiisii, oo biyuu
iyagii ku maydhay. 7 Oo wuxuu isagii u geliyey jubbaddii,
oo dhexdana wuxuu ugu xidhay dhex-xidhka, oo wuxuu u
geliyey khamiiskii, eefodkiina wuu u geliyey, oo dhexdana
wuxuu ugu xidhay dhex-xidhkii eefodka oo daabaca lahaa, oo
kaasuu isagii ku xidhay. 8 Oo haddana wuxuu isagii saaray
laabgashigii, oo laabgashigiina wuxuu geliyey Uuriimkii iyo
Tummiimkii. 9 Oo madaxana wuxuu u saaray duub, oo
duubka dhankiisa horena wuxuu ku dhejiyey waslad khafiif ah
oo dahab ah oo ah taajka quduuska ah sidii Rabbigu Muuse
ku amray. 10 Markaasaa Muuse soo qaaday saliidda lagu
subkado, oo wuxuu ku subkay taambuuggii iyo waxyaalihii
gudihiisa ku jiray oo dhan, oo dhammaantoodna quduus
buu ka dhigay. 11 Oo qaarkeedna wuxuu toddoba jeer ku
saydhsaydhay meeshii allabariga, oo wuxuu subkay meeshii
allabariga iyo weelasheedii oo dhan iyo berkeddii weysada
iyo salkeedii, si uu dhammaantood quduus uga dhigo. 12
Oo saliidda lagu subkado qaarkeedna wuxuu ku shubay
Haaruun madaxiisa, oo isagii wuu subkay si uu quduus uga
dhigo. 13 Oo haddana Muuse wuxuu soo kexeeyey wiilashii
Haaruun, oo wuxuu iyagii u geliyey jubbado, wuxuuna ugu
xidhay dhex-xidho, duubabna wuu u duubay sidii Rabbigu
Muuse ku amray. 14 Oo haddana wuxuu keenay dibigii

ahaa qurbaanka dembiga, oo Haaruun iyo wiilashiisiina
gacmahooday madaxa ka saareen dibigii qurbaankii dembiga
ahaa. 15 Markaasuu dibigii gowracay, oo Muuse wuxuu
soo qaaday dhiiggii, oo farta ku mariyey geesihii meesha
allabariga, oo meesha allabarigana sidaasuu ku daahiriyey,
kolkaasuu dhiigga ku ag shubay salkii meesha allabariga,
quduus buuna ka dhigay, si uu kafaaraggud ugu sameeyo.
16 Oo wuxuu qaaday kulli xaydhii uurka ku jirtay oo dhan, iyo
xuubkii beerka ku dul yiil, iyo labada kelyood iyo xaydhooda,
oo Muuse intaasuu ku dul gubay meesha allabariga. 17
Laakiinse dibigii iyo haraggiisii, iyo hilibkiisii, iyo uuskiisiiba
wuxuu ku gubay meel xerada dibaddeeda ah sidii Rabbigu
Muuse ku amray. 18 Oo haddana wuxuu keenay wankii
ahaa qurbaanka la gubo, oo Haaruun iyo wiilashiisiina
gacmahooday madaxa ka saareen wankii. 19 Oo isna wankii
wuu gowracay, markaasaa Muuse dhiiggii ku dul rusheeyey
hareeraha meesha allabariga. 20 Oo wankii xubin xubin buu
u kala googooyay, markaasaa Muuse wuxuu gubay madaxii
iyo xubnihii iyo xaydhii, 21 oo isna uurkujirtii iyo addimmadii
ayuu biyo ku maydhay, markaasaa Muuse wankii oo dhan
ku dul gubay meesha allabariga, waayo, kaasu wuxuu ahaa
qurbaan la gubo oo caraf udgoon loo bixiyo, wuxuuna ahaa
qurbaan Rabbiga dab loogu sameeyo, sidii Rabbigu Muuse
ku amray. 22 Oo haddana wuxuu keenay wankii kale, kaasoo
ahaa wankii quduuskadhigidda, oo Haaruun iyo wiilashiisiina
gacmahooday madaxa ka saareen wankii. 23 Markaasuu
wankii gowracay, oo Muuse wuxuu soo qaaday dhiiggii oo
wuxuu mariyey Haaruun caaradda dhegtiisa midig, iyo suulka
gacantiisa midig, iyo suulka cagtiisa midig. 24 Oo haddana
wuxuu keenay Haaruun wiilashiisii, kolkaasaa Muuse dhiiggii
mariyey caaradda dhegahooda midig, iyo suulka gacantooda
midig, iyo suulka cagtooda midig, oo Muusena wuxuu
dhiiggii ku dul rusheeyey hareeraha meesha allabariga. 25
Markaasuu soo qaaday baruurtii, iyo badhidii, iyo xaydhii
uurka ku jirtay oo dhan, iyo xuubkii beerka ku yiil, iyo labadii
kelyood, iyo xaydhoodii, iyo bowdadii midig. 26 Oo dambiishii
ay kibista aan khamiirka lahaynu ku jirtay oo Rabbiga hortiisa
tiilna wuxuu ka soo bixiyey xabbad ah kibis aan khamiir
lahayn, iyo xabbad ah moofo saliid leh, iyo xabbad canjeero
ah, oo wuxuu saaray baruurtii iyo bowdadii midig, 27 oo
intaas oo dhan ayuu saaray Haaruun gacantiisii, iyo gacantii
wiilashiisa, oo sida qurbaanka la ruxruxo ayaa Rabbiga
hortiisa lagu ruxruxay. 28 Kolkaasaa Muuse gacmahoodii
ka qaaday oo wuxuu qurbaankii la gubayay kula dul gubay
meesha allabariga, oo waxay ahaayeen quduuskadhigidda
oo caraf udgoon loo bixiyo. Taasu waxay ahayd qurbaan
Rabbiga dab loogu sameeyo. 29 Kolkaasaa Muuse qaaday
sakaarkii, oo Rabbiga hortiisa ayuu ugu ruxruxay qurbaan
la ruxruxo aawadiis, oo kaasu wuxuu ahaa qaybtii Muuse
ku lahaa wankii quduuskadhigidda sidii Rabbigu Muuse ku
amray. 30 Markaasaa Muuse qaaday saliiddii lagu subkado
qaarkeed iyo dhiiggii meesha allabariga ku kor yiil, oo wuxuu
ku kor saydhsaydhay Haaruun, iyo dharkiisii, iyo wiilashiisii,
iyo dharkii wiilashiisa, oo wuxuu quduus ka dhigay Haaruun
iyo dharkiisii iyo wiilashiisii iyo dharkii wiilashiisaba. 31
Markaasaa Muuse Haaruun iyo wiilashiisii ku yidhi, Hilibka
waxaad ku ag karisaan iridda teendhada shirka, oo halkaas
ku cuna hilibka iyo kibista dambiisha quduuskadhigidda ku
jirta, sidaan u amray, oo aan u idhi, Haaruun iyo wiilashiisu
waa inay cunaan. 32 Oo hilibka iyo kibista wixii ka hadhana
waa inaad dab ku gubtaan. 33 Oo idinkuna waa inaydaan ka
bixin iridda teendhada shirka intii toddoba maalmood ah, ilaa
maalmaha quduus laydinka dhigay ay dhammaystirmaan,
waayo, isagu wuxuu quduus idinka dhigayaa intii toddoba
maalmood ah. 34 Oo Rabbigu wuxuu amray in la yeelo sida
maantadan la yeelay, in kafaaraggud laydiin sameeyo. 35 Oo
intii toddoba maalmood ah habeen iyo maalinba waa inaad
ag joogtaan iridda teendhada shirka, oo Rabbiga amarkiisa
xajiya yeydnan dhimanine, waayo, sidaasaa laygu amray. 36
Oo Haaruun iyo wiilashiisiina way wada yeeleen waxyaalihii
Rabbigu amray oo uu gacanta Muuse u soo dhiibay oo
dhan.

9 Oo maalintii siddeedaad ayaa Muuse u yeedhay Haaruun
iyo wiilashiisii, iyo odayaashii reer binu Israa'iil, 2 oo
wuxuu Haaruun ku yidhi, Waxaad keentaa dibi yar oo
ah qurbaan dembi, iyo wan ah qurbaan la gubo oo aan
innaba iin lahayn, oo iyaga Rabbiga hortiisa ku bixi. 3 Oo
reer binu Israa'iilna la hadal oo waxaad ku tidhaahdaa,
Waxaad keentaan orgi ah qurbaan dembi, iyo weyl iyo
wan oo labadooduba gu jiraan oo aan innaba iin lahayn
oo qurbaan la gubo ah. 4 Oo dibi iyo wanna waxaad u
keentaan qurbaanno nabaadiino in Rabbiga hortiisa allabari
ahaan loogu bixiyo, iyo qurbaan hadhuudh ah oo saliid
lagu daray, waayo, maanta ayaa Rabbigu idiin muuqan
doonaa. 5 Oo iyana waxay teendhadii shirka horteeda
keeneen wixii Muuse amray, markaasay dadkii ururkii oo
dhammu soo dhowaadeen oo Rabbiga hortiisa istaageen. 6
Markaasaa Muuse wuxuu yidhi, Waxanu waa wixii Rabbigu
idinku amray inaad samaysaan, oo waxaa idiin muuqan
doona Rabbiga ammaantiisa. 7 Kolkaasaa Muuse wuxuu
Haaruun ku yidhi, Meesha allabariga u dhowow, oo waxaad
bixisaa qurbaankaaga dembiga iyo qurbaankaaga la gubo,
oo nafsaddaada kafaaraggud u samee, iyo weliba dadka

aawadiis, oo waxaad bixisaa dadka qurbaankiisii oo iyaga
kafaaraggud ugu samee sidii Rabbigu amray. 8 Sidaas
daraaddeed ayuu Haaruun u soo dhowaaday meeshii
allabariga, oo wuxuu gowracay weylkii isaga nafsaddiisa
u ahaa qurbaanka dembiga. 9 Oo wiilashii Haaruun ayaa
isagii u keeneen dhiiggii, oo isna fartiisii ayuu dhiiggii daray
oo wuxuu mariyey geesihii meesha allabariga, oo dhiigga
intiisii kalena wuxuu ku ag shubay salkii meesha allabariga.
10 Laakiinse xaydhii, iyo kelyihii, iyo xuubkii laga soo gooyay
beerkii qurbaanka dembiga wuxuu ku dul gubay meesha
allabariga sidii Rabbigu Muuse ku amray. 11 Oo hilibkii
iyo haraggiina wuxuu ku gubay meel xerada dibaddeeda
ah. 12 Oo haddana wuxuu gowracay neefkii qurbaanka la
gubo ahaa, markaasaa wiilashii Haaruun waxay isagii u
keeneen dhiiggii, oo isna wuxuu ku dul rusheeyey hareeraha
meesha allabariga. 13 Oo haddana waxay isagii u keeneen
neefkii qurbaankii la gubo oo cad cad ah iyo madaxii
neefka, oo isna wuxuu ku dul gubay meesha allabariga.
14 Markaasuu biyo ku maydhay uurkujirtii iyo addimmadii,
oo wuxuu ku dul gubay qurbaankii la gubayay oo meesha
allabariga saarnaa. 15 Oo haddana wuxuu keenay qurbaankii
dadka, oo wuxuu soo waday ridii dadka u ahayd qurbaankii
dembiga, wuuna gowracay oo u bixiyey dembi aawadiis,
siduu kan hore yeelay. 16 Oo haddana wuxuu keenay
neefkii qurbankii la gubo ahaa, oo si qaynuunka waafaqsan
ayuu u bixiyey. 17 Oo haddana wuxuu keenay qurbaankii
hadhuudhka, markaasuu cantoobo muggeed ka qaaday
oo ku dul gubay meesha allabariga, kaasoo ka gooni ah
qurbaankii la gubayay oo subaxnimada. 18 Oo weliba wuxuu
gowracay dibigii iyo wankii ahaa allabariga qurbaannada
nabaadiinada ah oo dadka aawadiis loo bixinayay; oo
markaasay wiilashii Haaruun isagii u keeneen dhiiggii, oo
isna wuxuu ku dul rusheeyey hareeraha meesha allabariga.
19 Markaasay keeneen baruurtii dibiga iyo tii wanka, iyo
badhidii, iyo xaydhii gudaha ku duubnayd, iyo kelyihii, iyo
xuubkii beerka. 20 Markaasay baruurtii saareen sakaarradii,
oo isna baruurtii buu ku dul gubay meeshii allabariga. 21
Kolkaasaa Haaruun Rabbiga hortiisa qurbaan la ruxruxo
ugu ruxruxay sakaarradii iyo bowdadii midig, sidii Muuse
amray. 22 Markaasaa Haaruun gacmihiisii ku soo taagay
dadka xaggiisii, oo wuu u duceeyey iyagii; markaasuu ka
soo degtay bixintii uu bixinayay qurbaankii dembiga, iyo
qurbaankii la gubayay, iyo qurbaannadii nabaadiinada. 23
Markaasay Muuse iyo Haaruun teendhadii shirka galeen,
oo haddana way ka soo bexeen oo dadkii u duceeyeen;
kolkaasaa ammaantii Rabbigu dadkii oo dhan u muuqatay.
24 Oo Rabbiga hortiisa waxaa ka yimid dab, oo meesha
allabariga dusheedii ayuu ku baabba'saday qurbaankii la
gubayay iyo baruurtii, oo dadkii oo dhammuna markay taas
arkeen ayay qayliyeen oo wejigooda u dheceen.

10 Oo Naadaab iyo Abiihuu oo ahaa wiilashii Haaruun
ayaa midkood waluba qaatay idankiisii, oo dab bay
ku rideen, fooxna way dul saareen, oo waxay Rabbiga
hortiisa ku bixiyeen dab qalaad oo uusan ku amrin. 2 Oo
dab baa Rabbiga hortiisa ka yimid, oo iyagii baabba'saday,
oo Rabbiga hortiisa ayay ku dhinteen. 3 Markaasaa Muuse
Haaruun ku yidhi, Tanu waa wixii Rabbigu ka hadlay,
oo uu yidhi, Aniga waa in quduus laygaga dhex dhigaa
kuwa ii soo dhowaada, oo waa in laygu ammaanaa dadka
oo dhan hortiisa. Oo Haaruunna wuu iska aamusay. 4
Markaasaa Muuse u yeedhay Miishaa'eel iyo Elsaafaan, oo
ahaa wiilashii Cusii'eel kaasoo ahaa Haaruun adeerkiis, oo
wuxuu ku yidhi, Soo dhowaada, oo walaalihiin ka soo qaada
meesha quduuska ah horteeda oo waxaad geeysaan xerada
dibaddeeda. 5 Sidaas daraaddeed way u dhowaadeen, oo
wayna qaadeen iyagoo jubbadahoodii gashan, waxayna
geeyeen xerada dibaddeedii sidii Muuse yidhi. 6 Markaasaa
Muuse ku yidhi Haaruun iyo wiilashiisii ahaa Elecaasaar
iyo Iitaamaar, Timaha madaxiinnu yaanay arbushnaan,
dharkiinnana ha dildillaacinina yeydnan dhimane, si aan
Rabbigu ugu cadhoon ururka oo dhan, laakiinse walaalihiin
ah reer binu Israa'iil oo dhammu ha ka ooyeen gubashadii
Rabbigu huriyey. 7 Oo idinku waa inaydaan ka bixin iridda
teendhada shirka yeydnan dhimane, waayo, waxaa korkiinna
ku taal saliiddii subkidda oo Rabbiga, oo iyana waxay yeeleen
si waafaqsan eraygii Muuse. 8 Markaasaa Rabbigu Haaruun
la hadlay, oo wuxuu ku yidhi, 9 Ha cabbina khamri amase
wax lagu sakhraamo, adiga iyo wiilashaada kula jira toona,
markaad teendhada shirka gashaan yeydnan dhimane, oo
taasu weligiin iyo ab ka ab qaynuun bay idiin ahaan doontaa,
10 oo waa inaad kala dudaan waxa quduuska ah iyo waxa
aan quduuska ahayn, iyo waxa nijaasta ah iyo waxa daahirka
ah; 11 iyo inaad reer binu Israa'iil bartaan kulli qaynuunnadii
Rabbigu iyaga kula hadlay oo uu gacanta Muuse ugu soo
dhiibay oo dhan. 12 Kolkaasaa Muuse la hadlay Haaruun,
iyo wiilashiisii hadhay oo ahaa Elecaasaar iyo Iitaamaar, oo
wuxuu ku yidhi, Qurbaanka hadhuudhka ah oo ka hadhay
qurbaannadii Rabbiga dabka loogu sameeyey qaata oo
isagoo aan khamiir lahayn ku cuna meesha allabariga
dhinaceeda, waayo, kaasu waa kan ugu wada quduusan. 13
Oo waa inaad ku cuntaan meel quduus ah, maxaa yeelay,
waa intii adiga iyo wiilashaadaba looga amray qurbaannada
Rabbiga oo dabka lagu sameeyo, waayo, aniga sidaasaa

laygu amray. 14 Oo sakaarka la ruxruxo iyo bowdada sare
loo qaado waa inaad meel daahirsan ku cuntaan adiga iyo
wiilashaada iyo gabdhahaaga kula jiraaba, waayo, kuwaasu
waa intii adiga iyo wiilashaada looga amray allabaryada
qurbaannada nabaadiinada ah oo reer binu Israa'iil ay
bixiyaan. 15 Oo iyagu bowdada sare loo qaado iyo sakaarka
la ruxruxo waa inay la keenaan qurbaannada xaydha oo
dabka lagu sameeyo, in iyaga Rabbiga hortiisa lagu ruxruxo
sidii qurbaanka la ruxruxo, oo markaasay ahaan doonaan
inta weligiin laydiin amray adiga iyo wiilashaadaba, sidii
Rabbigu amray. 16 Oo Muuse aad buu u doondoonay ridii
ahayd qurbaanka dembiga, markaasuu ogaaday in la gubay,
kolkaasuu ku xanaaqay Elecaasaar iyo Iitaamaar oo ahaa
Haaruun wiilashiisii hadhay, oo wuxuu iyagii ku yidhi. 17 War
maxaad qurbaanka dembiga ugu cuni weydeen meesha
quduuska ah gudaheeda, maxaa yeelay, kaasu waa kan
ugu wada quduusan, oo isagu wuxuu kaas idiin siiyey inaad
qaaddaan xumaantii ururka oo aad iyaga Rabbiga hortiisa
kafaaraggud ugu samaysaan? 18 Bal eega, orgiga dhiiggiisii
lama soo gelin meesha quduuska ah gudaheeda. Sida
xaqiiqada ah waxaa idiin ekayd inaad meesha quduuska ah
gudaheeda ku cuntaan, sidaan idinku amray. 19 Markaasaa
Haaruun la hadlay Muuse, oo wuxuu ku yidhi, Bal eeg,
maantadan ayay Rabbiga hortiisa ku bixiyeen qurbaankoodii
dembiga iyo qurbaankoodii la gubayay, oo aniga waxaa
igu dhacay wax sidan oo kale ah, oo maanta haddaan
cuno qurbaankii dembiga, taasu Rabbiga hortiisa ma ku
wanaagsanaan lahayd? 20 Muusena markuu taas maqlay
raalli buu ka noqday.

**11** Markaasaa Rabbigu la hadlay Muuse iyo Haaruun,
oo wuxuu ku yidhi. 2 Reer binu Israa'iil la hadla, oo
waxaad ku tidhaahdaan, Kuwanu waa waxyaalaha noolnool
oo aad ka cunaysaan xayawaanka dhulka jooga oo dhan,
3 Wax alla wixii xayawaan ah oo raafkoodu kala jeexan
yahay, oo qanjaafilo leeyahay, oo calyanaqsiga raamsado
waa inaad cuntaan. 4 Habase yeeshee, kuwan oo ka mid
ah kuwa calyanaqsiga raamsado oo raafka jeexan leh
waa inaydaan cunin, kuwaasoo ah geela, maxaa yeelay,
calyanaqsiga wuu raamsadaa, laakiinse raafkiisu ma kala
jeexna, haddaba isagu waa idinka nijaas. 5 Oo waladana ha
cunina, maxaa yeelay, iyadu calyanaqsiga way raamsataa,
laakiinse raafkeedu ma kala jeexna, haddaba iyadu waa
idinka nijaas. 6 Oo bakaylahana ha cunina, maxaa yeelay,
isagu calyanaqsiga wuu raamsadaa, laakiinse raafkiisu
ma kala jeexna, haddaba isagu waa idinka nijaas. 7 Oo
doofaarkana ha cunina, maxaa yeelay, isaga raafkiisu
waa kala jeexan yahay, oo qanjaafiluu leeyahay, laakiinse
calyanaqsiga ma raamsado, sidaas daraaddeed isagu waa
idinka nijaas. 8 Haddaba kuwaas hilibkooda waa inaydaan
cunin, oo baqtigoodana waa inaydaan taaban, maxaa yeelay,
iyagu waa idinka nijaas. 9 Waxa biyaha ku dhex jira oo
dhan kuwan ka cuna: wax alla wixii baalal iyo qolfo leh
oo ku dhex jira biyaha iyo badaha iyo webiyada cuna. 10
Laakiinse wax alla wixii aan baalal iyo qolfo lahayn oo ku
dhex jira badaha iyo webiyada, iyo waxa biyaha ku dhex
dhaqdhaqaaqa oo dhan, iyo kulli waxyaalaha noolnool oo
biyaha ku dhex jira oo dhammu waa idinka karaahiyo. 11
Haddaba iyagu waa inay karaahiyo idinka ahaadaan; idinku
waa inaydaan hilibkooda cunin, oo baqtigoodana waa inuu
karaahiyo idinka ahaadaa. 12 Wax alla wixii biyaha ku dhex
jira oo aan lahayn baalal iyo qolfo waa idinka karaahiyo.
13 Oo haaddana waxaa idinka karaahiyo ah kuwan, oo
iyaga waa inaan la cunin, waayo, iyagu waa karaahiyo,
waana baqalyada, iyo babawga, iyo saratoosiyaha, 14 iyo
xuunshada, iyo shimbirlaayaha, iyo faragooysta caynkeeda,
15 iyo cayn kasta oo tuke ah, 16 iyo gorayada, iyo aboodiga,
iyo shimbirbadeedda, iyo cayn kasta oo haadka adag, 17 iyo
guumaysta yar, iyo xeebajoogta iyo guumaysta weyn, 18 iyo
guumaysgeesaleyda, iyo cantalyaaga, iyo gorgorka, 19 iyo
xuurta, iyo haadbiyoodda iyo caynteeda, iyo ceelajoogjoogta,
iyo fiidmeerta. 20 Oo wax baalal leh oo gurguurta oo afarta
addinba ku socda dhammaantood waa idinka karaahiyo. 21
Laakiinse wax baalal leh oo gurguurta oo afarta addinba
ku socda dhammaantood waxaad ka cuni kartaan kuwa
addimmada ku leh cagahooda ka kor, oo dhulka ku kor
boodbooda, 22 iyaga waxaad ka cuntaan kuwa caynkan ah
oo ah ayaxa iyo caynkiisa, iyo kabajaanka iyo caynkiisa,
iyo jiriqsiga iyo caynkiisa, iyo koronkorrada iyo caynkeeda.
23 Laakiinse wax baalal leh oo gurguurta oo afarta cagood
lahu, waa idinka karaahiyo. 24 Oo kuwaas idinku waad ku
nijaasoobaysaan, oo ku alla kii baqtigooda taabtaa nijaas
buu ahaanayaa tan iyo fiidkii, 25 oo ku alla kii baqtigooda
wax ka qaadaa waa inuu dharkiisa maydhaa, oo nijaas buu
ahaanayaa tan iyo fiidkii. 26 Xayawaan kasta oo raafkiisu
kala jeexan yahay, oo aan qanjaafilo lahayn ama aan
calyanaqsiga raamsan waa idinka nijaas, oo ku alla kii iyaga
taabtaana wuu nijaasoobayaa. 27 Oo xayawaanka afarta
addinba ku socda, wax alla wixii baabacooyinka ku socdaa
waa idinka nijaas, oo ku alla kii baqtigooda taabtaa nijaas
buu ahaanayaa tan iyo fiidkii. 28 Oo kii baqtigooda qaadaana
waa inuu dharkiisa maydhaa, oo tan iyo fiidkiina nijaas buu
ahaanayaa, waayo, iyagu waa idinka nijaas. 29 Oo waxa
dhulka ku gurguurta oo dhan kuwanu waa kuwa idinka nijaas

ah, waana fadhanfadhka, iyo jiirka, iyo amuurka iyo caynkiisa
oo dhan, 30 iyo ilweynta iyo maansalugaleyda, iyo qorratada,
iyo mulaca, iyo jirjirroolaha. 31 Oo waxa gurguurta oo dhan
kuwaasu waa kuwa idinka nijaas ah, oo ku alla kii taabtaa
markay dhintaan nijaas buu ahaan doonaa tan iyo fiidkii. 32
Oo wax alla wixii ay ku dhacaan markay dhintaan, nijaas
bay ahaan doonaan, hadday yihiin weel qori ah, ama dhar,
ama harag, ama joonyad, weelkaasu wax kasta ha ahaadee
haddii wax loogu isticmaalo waa in biyo la dhex geliyaa,
oo tan iyo fiidkiina nijaas buu ahaanayaa, oo markaas
dabadeedna daahir buu ahaanayaa. 33 Oo weelkii dhoobo
ah oo mid iyaga ka mid ahu gudihiisa ku dhaco, wax alla
wixii weelkaas gudihiisa ku jiraaba way nijaasoobi doonaan,
oo weelkiina waa inaad jebisaan. 34 Oo waxa la cuno oo ku
jira oo biyo gaadhaanba way nijaasoobi doonaan, oo weelka
caynkaas ah waxa la cabbo oo ku jira oo dhammuna way
nijaasoobi doonaan. 35 Oo wax alla wixii wax baqtigooda
ahu ku dhacaanba way nijaasoobi doonaan, hadday yihiin
foorno ama sholad, waa in la burburiyaa, waayo, iyagu
waa nijaas, waana inay nijaas idinka ahaadaan. 36 Habase
yeeshee il amase god ay biyo badanu ku jiraan daahir
bay ahaanayaan, laakiinse wixii baqtigooda taabtaa way
nijaasoobayaan. 37 Oo wax baqtigooda ahu hadday ku
dhacaan abuur la abuurayo, kaasu waa daahir. 38 Laakiinse
abuurka haddii biyo lagu shubo oo wax baqtigooda ahu ay
ku dhacaan markaas waa idinka nijaas. 39 Oo xayawaanka
aad cuni kartaan midkood hadduu dhinto, kii baqtigiisa
taabtaa nijaas buu ahaanayaa tan iyo fiidkii. 40 Oo neefkaas
baqtigiisa qofkii cunaana waa inuu dharkiisa maydhaa, oo
isna nijaas buu ahaanayaa tan iyo fiidkii, oo kii neefka
baqtigiisa qaadaana waa inuu dharkiisa maydhaa, oo isna
nijaas buu ahaanayaa tan iyo fiidkii. 41 Oo wax kasta oo
dhulka ku gurguurtaaba waa karaahiyo, oo waa inaan la
cunin. 42 Wax alla wixii bogga ku socda, iyo wax alla wixii
afar addin ku socda, amase wax alla wixii addimmo badan
leh, kuwaas oo ah waxyaalaha dhulka ku gurguurta oo
dhan, waa inaydaan cunin, waayo, iyagu waa karaahiyo. 43
Idinku waa inaydaan karaahiyo iskaga dhigin waxa dhulka
ku gurguurta oo dhan, oo waa inaydaan iyaga isku nijaasayn
si aydaan iyaga ugu nijaasoobin. 44 Waayo, anigu waxaan
ahay Rabbiga Ilaahiinna ah, haddaba isdaahiriya oo quduus
ahaada, maxaa yeelay, anigu quduus baan ahay. Oo waa
inaydaan isku nijaasayn cayn kasta oo ah waxa gurguurta
oo dhulka ku kor dhaqdhaqaaqa. 45 Waayo, anigu waxaan
ahay Rabbigii dalkii Masar idinka soo bixiyey inuu Ilaah idiin
ahaado, haddaba sidaas daraaddeed waa inaad quduus
ahaataan, waayo, anba quduus baan ahay. 46 Haddaba
intaasu waa sharciga ku saabsan xayawaanka, iyo haadda,
iyo wax kasta oo nool oo biyaha ku dhex dhaqdhaqaaqa, iyo
wax kasta oo dhulka ku gurguurta; 47 si loo kala duwo waxa
nijaasta ah iyo waxa daahirka ah, iyo waxa nool oo la cuni
karo iyo waxa nool ee aan la cuni karin.

12 Markaasaa Rabbigu Muuse la hadlay oo wuxuu ku
yidhi, 2 Reer binu Israa'iil la hadal oo waxaad ku
tidhaahdaa, Haddii naagu ilmo uuraysato oo ay wiil dhasho,
markaas intii toddoba maalmood ah waa inay nijaas ahaataa,
oo waxay u nijaasoobaysaa siday nijaasta u ahayd maalmihii
dhiiggeeda. 3 Oo maalinta siddeedaadna wiilka buuryadiisa
ha la gudo. 4 Oo iyadu waa inay ku sii jirtaa dhiigga
isdaahirinteeda saddex iyo soddon maalmood oo kale, oo
waa inayan taaban wax quduus ah, waana inayan meesha
quduuska ah gelin ilamaa maalmaha isdaahirinteedu ay
dhammaystirmaan. 5 Laakiinse hadday gabadh dhasho,
markaas intii laba toddobaad ah waa inay nijaas ahaataa
sidii markay xagga dhiigga nijaas ka tahay, oo waa inay ku sii
jirtaa dhiigga isdaahirinteeda lix iyo lixdan maalmood oo kale.
6 Oo markii maalmaha isdaahirinteedu ay dhammaystirmaan
wiilkeeda aawadiis ama gabadheeda aawadeed waa inay
keentaa wan gu jira oo qurbaan la gubo aawadiis loo bixiyo,
iyo xamaam yar ama qoolley oo qurbaan dembi aawadiis
loo bixiyo oo waa inay wadaadka ugu keentaa teendhada
shirka iriddeeda. 7 Oo isna qurbaankaas waa inuu ku
bixiyaa Rabbiga hortiisa, oo waa inuu iyada kafaaraggud u
sameeyaa, oo iyana dhiigbixiddeeda way ka daahirsanaan
doontaa. Kanu waa sharciga ku saabsan tii dhasha ama
wiil ha ahaado ama gabadhe. 8 Oo haddii lacagteedu ayan
wan ugu filnaynna waa inay keentaa laba qoolley ama laba
xamaam oo yaryar, oo midkood waa in loo bixiyaa qurbaan la
gubo aawadiis, kan kalena waa in loo bixiyaa qurbaan dembi
aawadiis, oo wadaadkuna waa inuu iyada kafaaraggud u
sameeyaa, oo iyana daahir bay ahaan doontaa.

13 Markaasaa Rabbigu la hadlay Muuse iyo Haaruun
oo wuxuu ku yidhi, 2 Haddii qof jidhkiisa lagu arko
barar, ama qolof, ama bar dhalaalaysa, oo ay jidhkiisa
ku noqoto cudurkii baraska, markaas waa in loo keenaa
wadaadka Haaruun ah, amase wiilashiisa wadaaddada
ah midkood, 3 oo wadaadku waa inuu fiiriyaa cudurka
jidhka ku yaal, oo haddii meesha cudurka leh timaheedu
ay caddaadeen, oo cudurka muuqashadiisu ay dubka sare
hoos u sii dhaafsiisan tahay, markaas waa cudurkii baraska,
oo wadaadku waa inuu fiiriyaa oo yidhaahdaa, Ninkanu waa
nijaasaysan yahay. 4 Laakiinse haddii barta dhalaalaysaa ay
jidhka sare ka cad dahay, oo muuqashadeeduna ayan dubka

sare hoos u sii dhaafsiisnayn, oo meeshaas timaheeduna ayan caddaan, markaas waa in wadaadku qofkaas cudurka qaba karantiilaa intii toddoba maalmood ah. **5** Oo haddana wadaadku maalinta toddobaad waa inuu isaga fiiriyaa, oo bal eeg, hadduu indhihiisa ku arko in cudurku joogsaday oo uusan dubka sare ku sii faafin, markaas waa in wadaadku qofkaas sii karantiilaa toddoba maalmood oo kale. **6** Oo haddana maalinta toddobaad waa in wadaadku fiiriyaa, oo bal eeg, haddii cudurkii yaraaday oo uusan dubka sare ku sii faafin, markaas wadaadku ha yidhaahdo, Ninkanu waa daahir, oo meeshu waa qolof keliya, oo isna dharkiisa ha maydho oo daahir ha ahaado. **7** Laakiinse qoloftu hadday jidhka ku sii faafto markii u daahirintiisa aawadeed wadaadka isu tuso dabadeed, waa inuu wadaadka mar kale istusaa. **8** Oo wadaadku waa inuu fiiriyaa, oo bal eeg, haddii qoloftu ay jidhka ku faafto, markaas wadaadku waa inuu yidhaahdaa, Ninkanu waa nijaasaysan yahay, waayo, kaasu waa baras. **9** Oo haddii nin cudurka baraska qabo waa in wadaadka loo keenaa, **10** oo wadaadku waa inuu fiiriyaa, oo bal eeg, haddii dubka sare barar cadu ku yaal, oo meeshaas timaheeduna ay caddaadeen, oo bararkana haddii boog xun ku dhex taal, **11** kaasu waa baras gaboobay oo dubka jidhka ku dhex jira, oo wadaadku kaas waa inuu yidhaahdaa, Ninkanu waa nijaasaysan yahay, oo isaga waa inuusan karantiilin, waayo, isagu waa nijaas. **12** Oo haddii barasku dubka ku faafo, oo uu barasku kan cudurka qaba dubkiisa oo dhan qariyo tan iyo madaxiisa iyo ilaa cagihiisa, in alla intii wadaadka u muuqata, **13** markaas wadaadku waa inuu qofkaas fiiriyaa, oo bal eeg, haddii barasku jidhkiisa oo dhan ku faafay, markaas isagu kan cudurka qaba waa inuu ku yidhaahdaa, Ninkanu waa daahir, waayo, isagu wuu wada caddaaday oo waa daahir. **14** Laakiinse mar alla markii boog xumu isaga ka muuqdo, waa inuu nijaas ahaadaa. **15** Oo wadaadku waa inuu boogtii xumayd fiiriyaa oo waa inuu yidhaahdaa, Ninkanu waa nijaasaysan yahay, waayo, boogta xumu waa nijaas oo waa baras. **16** Oo boogta xumu hadday mar kale beddelanto oo caddaato, markaas isagu waa inuu wadaadka u yimaadaa, **17** oo wadaadkuna waa inuu fiiriyaa, oo bal eeg, haddii cudurkii caddaaday, markaas wadaadku kan cudurka qabi jiray ha ku yidhaahdo, Waa daahir, isagu waa daahir. **18** Oo haddii jidhku kasoobax ku leeyahay dubka sare oo uu bogsaday, **19** oo kasoobaxa meeshuu ku yaal haddii lagu arko barar cad ama bar dhalaalaysa oo ah guduud caddaan ku jiro, markaas waa in wadaadka la tusaa. **20** Oo wadaadku waa inuu fiiriyaa, oo bal eeg, haddii muuqashadeedu hoos u sii dhaafsiisan tahay dubka sare oo meeshaas timaheeduna ay caddaadeen, markaas wadaadku waa inuu yidhaahdaa, Ninkanu waa nijaasaysan yahay, waayo, taasu waa cudurkii baraska oo soo baxay. **21** Laakiinse haddii wadaadku fiiriyo, oo meeshaas timo cad laga waayo, oo nabarkuna uusan dubka sare hoos u sii dhaafsiisnayn, illowse uu sii yaraaday, markaas waa in wadaadku karantiilaa intii toddoba maalmood ah, **22** oo haddii cudurku dubka sare ku sii faafo, markaas wadaadku ha yidhaahdo, Ninkanu waa nijaasaysan yahay, waayo, kaasu waa cudur. **23** Laakiinse bartii dhalaalaysay hadday meesheedii ku joogsatay oo ayan sii faafin, markaas waa astaantii kasoobaxii ka hadhay, oo wadaadku waa inuu yidhaahdaa, Ninkanu waa daahir. **24** Amase haddii dubka jidhku dab ku gubto oo jidhkii gubtay uu noqdo bar dhalaalaysa oo ah guduud caddaan ku jiro, amase caddaan, **25** markaas wadaadku waa inuu meeshaas fiiriyaa, oo bal eeg, barta dhalaalaysa timaheedu hadday caddaadeen oo nabarka muuqashadiisuna ay dubka sare hoos u sii dhaafsiisan tahay, waa baras kaasu, oo wuxuu ka soo dhex baxay meeshii gubatay, oo wadaadku waa inuu yidhaahdaa, Ninkanu waa nijaasaysan yahay, waayo, kaasu waa cudurkii baraska. **26** Laakiinse haddii wadaadku fiiriyo, oo barta dhalaalaysa laga waayo timo cad, oo nabarkuna uusan dubka sare hoos u sii dhaafsiisnayn laakiinse uu yaraaday, markaas wadaadku waa inuu qofkaas karantiilaa intii toddoba maalmood ah. **27** Oo maalinta toddobaad waa in wadaadku qofkaas fiiriyaa, oo haddii nabarku dubka sare ku faafay, markaas wadaadku waa inuu yidhaahdaa, Ninkanu waa nijaasaysan yahay, waayo, kaasu waa cudurkii baraska. **28** Laakiinse bartii dhalaalaysay hadday meesheedii ku joogsatay, oo ayan dubka sare ku sii faafin, illowse ay yaraatay, markaas waa bararkii meeshii gubatay, oo wadaadku waa inuu yidhaahdaa, Ninkanu waa daahir, waayo, taasu waa astaantii gubashada. **29** Haddii nin ama naagu ay cudur ku yeeshaan madaxa amase gadhka, **30** markaas wadaadku waa inuu cudurka fiiriyaa, oo bal eeg, haddii cudurka muuqashadiisu ay dubka sare hoos u sii dhaafsiisan tahay, oo meeshaasna ay ku yaalliin timo casuur ah oo khafiif ah, markaas wadaadku waa inuu yidhaahdaa, Ninkanu waa nijaasaysan yahay, waayo, taasu waa cambaar oo waa baraskii madaxa iyo gadhka. **31** Oo wadaadku hadduu fiiriyo cudurka cambaarta ah, oo bal eeg, haddii muuqashadeedu ayan dubka sare hoos u sii dhaafsiisnayn, oo aan timo madoobu meeshaas ku oollin, markaas wadaadku waa inuu karantiilaa kan cudurka cambaarta ah qaba intii toddoba maalmood ah. **32** Oo maalinta toddobaad wadaadku waa inuu cudurka fiiriyaa, oo bal eeg, haddii cambaartii ayan sii faafin, oo aan lagu arag timo casuur ah, oo cambaarta muuqashadeedu ayan

dubka sare ka sii dhaafsiisnayn, 33 markaas isagu waa inuu xiirto, laakiinse meesha cambaarta leh yuusan xiirin, oo wadaadku waa inuu qofkaas karantiilaa toddoba maalmood oo kale. 34 Oo haddana maalinta toddobaad wadaadku waa inuu cambaartii fiiriyaa, oo bal eeg, cambaartu haddii ayan dubka sare ku sii faafin, oo muuqashadeeduna ayan dubka sare hoos u sii dhaafsiisnayn, markaas wadaadku waa inuu yidhaahdaa, Ninkanu waa daahir, oo isna waa inuu dharkiisa maydhaa oo uu daahir ahaadaa. 35 Laakiinse cambaartii haddii ay dubka sare ku sii faafto daahirintiisa dabadeed, 36 markaas wadaadku waa inuu fiiriyaa, oo bal eeg, haddii cambaartu ay dubka sare ku sii faaftay wadaadku yuusan sii doondoonin timo casuur ah, waayo, ninkanu waa nijaasaysan yahay. 37 Laakiinse cambaartu hadday indhihiisa la ahaato inay joogsatay oo timo madoobuna ay ka bexeen, markaas cambaartu waa bogsatay, oo ninkaasuna waa daahir, oo wadaadkuna waa inuu yidhaahdaa, Ninkanu waa daahir. 38 Oo haddii nin ama naagu ay dubka jidhkooda ku yeeshaan baro dhaldhalaalaya, oo ah baro cadcad oo dhaldhalaalaya, 39 markaas wadaadku waa inuu fiiriyaa, oo bal eeg, haddii baraha dhaldhalaalaya oo dubka jidhkooda ku yaallaa ay yihiin caddaan khafiif ah, taasu waa xaajiin jidhka ka soo baxday, oo qofkaasu waa daahir. 40 Oo haddii nin madaxiisa ay timahu ka dhammaadaan, isagu wuxuu leeyahay bidaar, hase ahaatee waa daahir. 41 Oo haddii timihiisu ay foodda hore ka dhammaadaanna, isagu foodda horuu bidaar ku leeyahay, hase ahaatee waa daahir. 42 Laakiinse madaxa bidaarta leh ama foodda bidaarta leh haddii lagu arko cudur guduudan oo caddaan ku jiro, markaas waa baras ka soo baxay madaxiisii bidaarta lahaa ama fooddiisii bidaarta lahayd. 43 Markaas wadaadku waa inuu fiiriyaa, oo bal eeg, cudurka bararkiisu hadduu yahay mid guduudan oo caddaan ku jiro, oo ku yaal madaxiisa bidaarta leh, ama fooddiisa bidaarta leh, sidii ay tahay muuqashada baraska oo dubka jidhkiisa ku taal, 44 isagu waa nin baras qaba, oo waa nijaasaysan yahay, oo sida xaqiiqada ah wadaadku waa inuu yidhaahdaa, Ninkanu waa nijaasaysan yahay; oo cudur buu madaxa ka qabaa. 45 Oo qofkii cudurka baraska qaba dharkiisu wax jeexjeexan ha ahaadeen, oo timaha madaxiisuna ha bannaanaadeen, oo bushintiisa sarena ha daboolo, oo ha ku qayliyo, Waan nijaasaysnahay, waan nijaasaysnahay! 46 Oo in alla intuu cudurkaas qabo oo dhan isagu waa inuu nijaasaysnaadaa, waayo, isagu waa nijaasaysan yahay, oo waa inuu keligiis meel ku hoydaa, oo hoygiisuna waa inuu ahaadaa xerada dibaddeeda. 47 Oo dharkii uu cudurka barasku ku yaal, hadduu yahay dhar dhogor idaad ah amase dhar wanaagsan oo linen ah, 48 hadduu ku jiro dunta fidsan amase tan gudubsan ee dharka wanaagsan oo linenka ah, ama kan dhogorta idaad ah, iyo hadduu ku jiro haragga ama wax alla wixii harag laga sameeyo, 49 haddii cudurku ka cagaaran yahay ama ka guduudan yahay dharka ama haragga ama dunta fidsan ama tan gudubsan ama waxa alla wixii harag laga sameeyo, kaasu waa cudurkii baraska oo waa in wadaadka la tusaa. 50 Oo wadaadkuna waa inuu fiiriyaa cudurkaas, oo waxaas cudurka qabana waa inuu meel ku xereeyaa intii toddoba maalmood ah. 51 Oo haddana maalinta toddobaad waa inuu cudurka fiiriyaa, oo haddii cudurku dharka kaga sii faafay dunta fidsan ama tan gudubsan, ama haragga dhexdiisa, haraggaas hawl kasta oo loogu isticmaalaba, markaas cudurku waa baras wax xaganaya oo waxaasu waa nijaasaysan yahay. 52 Oo isna waa inuu gubaa dharkaas cudurku ku jiro, hadduu yahay dunta fidsan ama tan gudubsan oo ku jirta dharka dhogorta idaad ah ama kan wanaagsan oo linenka ah, ama wax kasta oo harag laga sameeyey, waayo, kaasu waa baras wax xaganaya, ee waa in dab lagu gubaa. 53 Oo haddii wadaadku fiiriyo, oo markaa cudurkii uusan dharka kaga sii faafin dunta fidsan ama tan gudubsan toona, ama wax harag laga sameeyey, 54 markaas wadaadku waa inuu ku amraa in la maydhaa waxaas cudurka qaba, oo isagu haddana waa inuu waxaas meel ku xereeyaa intii toddoba maalmood oo kale ah. 55 Oo wadaadku waa inuu fiiriyaa, markii cudurka laga maydho dabadeed, oo bal eeg, cudurka midabkiisu hadduusan beddelmin, iyo haddii cudurku uusan faafinba, waxaasu waa nijaas, oo waa inaad dab ku gubtaa, oo haddii meeshii xumayd kaga taal hoosta ama dushaba, taasu waa wax xaganaya. 56 Oo haddii wadaadku fiiriyo, oo bal eeg, cudurku hadduu yaraaday markii la maydhay dabadeed, markaas isagu waa inuu intaas ka dillaaciyaa dharka ama haragga ama dunta fidsan ama tan gudubsan. 57 Oo haddii cudurkii weli dharkii kaga sii muuqdo dunta fidsan ama tan gudubsan ama wax kasta oo harag laga sameeyey markaas waa inaad dab ku gubtaa waxa cudurku ku yaal, maxaa yeelay, cudurku waa soo faafayaa. 58 Oo dharkii ha ahaado dunta fidsan ama tan gudubsan ama wax alla wixii harag laga sameeyey oo aad maydho, haddii cudurku iyaga ka baxo, haddana waa in mar labaad la maydhaa, oo kolkaasay daahir ahaan doonaan. 59 Kanu waa sharciga ku saabsan cudurka baraska ahu markuu dharka dhogorta idaad ah ama dharka wanaagsan oo linenka ah kaga dhaco dunta fidsan ama tan gudubsan, ama waxa kasta oo harag laga sameeyo, in la yidhaahdo, Waxaasu waa daahir, ama in la yidhaahdo, Waa nijaas.

**14** Markaasaa Rabbigu Muuse la hadlay oo wuxuu ku
yidhi, **2** Kanu waa inuu ahaadaa sharciga ku saabsan
qofkii baras qaba maalinta la daahirinayo: Waa in isaga
wadaadka loo keenaa. **3** Oo wadaadku waa inuu xerada
dibadda uga baxaa, oo waa inuu qofkaa fiiriyaa, oo bal eeg,
cudurkii barasku hadduu ka bogsaday qofkii baraska qabay,
**4** markaas wadaadku waa inuu amraa in kan la daahirinayo
aawadiis loo keeno laba shimbirrood oo noolnool oo daahir
ah, iyo qori kedar ah, iyo wax casaan ah, iyo geed husob la
yidhaahdo. **5** Oo wadaadku waa inuu amraa in shimbirraha
middood lagu dhex gowraco weel dhoobo ah oo biyo socda
korkooda ah. **6** Oo shimbirta nool iyo qoriga kedarka ah,
iyo waxa casaanta ah iyo geedka husobka ahba waa inuu
soo qaadaa oo iyaga iyo shimbirta noolba waa inuu dhex
geliyaa dhiigga shimbirtii biyaha socda lagu kor gowracay.
**7** Oo wadaadkuna kan baraska laga daahirinayo toddoba
jeer waa inuu dhiigga ku saydhaa oo waa inuu yidhaahdaa,
Kanu waa daahir. Oo shimbirta noolna berrin bannaan ha ku
sii daayo. **8** Oo kan la daahirinayaana waa inuu dharkiisa
maydhaa oo timihiisa oo dhanna iska xiiraa, oo isna biyo ku
maydhaa, kolkaasuu daahir noqon doonaaye, oo markaas
dabadeedna waa inuu xerada soo galaa, laakiinse intii
toddoba maalmood ah waa inuu teendhadiisa dibaddeeda ku
hoydaa. **9** Oo maalinta toddobaad waa inuu timaha ka wada
xiiraa madaxa iyo gadhka iyo suunniyadaba. Xataa timihiisa
oo dhan waa inuu iska wada xiiraa, oo waa inuu dharkiisana
maydhaa, jidhkiisana biyo ku maydhaa, kolkaasuu daahir
noqon doonaaye. **10** Oo maalinta siddeedaadna isagu waa
inuu keenaa laba wan oo yaryar oo aan innaba iin lahayn,
iyo nayl gu jira oo aan iin lahayn, iyo eefaah toban meelood
loo dhigay saddexdiis meelood oo bur ah oo saliid lagu
daray, kaasoo ah qurbaan hadhuudh, iyo qiyaas log la
yidhaahdo oo saliid ah. **11** Oo wadaadka isaga daahirinayaa
waa inuu kan la daahirinayo iyo alaabtiiba keenaa Rabbiga
hortiisa, meel iridda teendhada shirka agteeda ah. **12** Oo
wadaadku waa inuu soo qaadaa wananka midkood oo waa
inuu u bixiyaa qurbaan xadgudub aawadiis, oo weliba waa
inuu logga saliidda ah qaadaa oo uu iyaga Rabbiga hortiisa
ugu ruxruxaa qurbaan la ruxruxo. **13** Oo wanka waa inuu
ku gowracaa meesha lagu gowraco qurbaanka dembiga
iyo qurbaanka la gubo oo ku dhex taal meesha quduuska
ah, waayo, sida qurbaanka dembigu uu kii wadaadka u
yahay ayaa qurbaanka xadgudubkuna kiisii u yahay. Waa
kan ugu quduusan. **14** Oo wadaadku waa inuu qaadaa
dhiigga qurbaanka xadgudubka qaarkiis, oo waa inuu dhiigga
taabsiiyaa kan la daahirinayo caaradda dhegtiisa midig, iyo
suulka gacantiisa midig, iyo suulka cagtiisa midigba. **15** Oo
wadaadku waa inuu qaadaa loggii saliidda ahaa qaarkiis
oo waa inuu calaacasha gacantiisa bidix ku shubaa. **16** Oo
wadaadku waa inuu fartiisa midig daraa saliidda ku jirta
calaacashiisa bidix, oo waa inuu toddoba jeer saliidda fartiisa
kula saydhaa Rabbiga hortiisa. **17** Oo saliidda inteeda kale
oo gacantiisa ku hadhayna waa in wadaadku taabsiiyaa
kan la daahirinayo caaradda dhegtiisa midig, iyo suulka
gacantiisa midig, iyo suulka cagtiisa midig, oo ha ka kor
mariyo dhiiggii qurbaanka xadgudubka. **18** Oo saliidda
inteeda kale oo ku jirta wadaadka calaacashiisana waa inuu
taabsiiyaa kan la daahirinayo madaxiisa, oo wadaadku waa
inuu isaga Rabbiga hortiisa kafaaraggud ugu sameeyaa.
**19** Oo wadaadku waa inuu bixiyaa qurbaanka dembiga, oo
waa inuu nejisnimadiisii daraaddeed kan la daahirinayo
aawadiis kafaaraggud u sameeyaa, oo dabadeedna waa inuu
gowracaa neefkii ahaa qurbaanka la gubo, **20** oo wadaadku
waa inuu meesha allabariga ku dul bixiyaa qurbaanka
la gubo iyo qurbaanka hadhuudhka, oo wadaadku waa
inuu isaga kafaaraggud u sameeyaa, oo isna daahir buu
ahaan doonaa. **21** Laakiinse isagu hadduu miskiin yahay
oo uusan intaas oo dhan wada heli karin, markaas waa
inuu keenaa wan yar oo qurbaankii xadgudubka aawadiis
loo ruxruxo si uu kafaaraggud ugu sameeyo, iyo eefaah
toban meelood loo dhigay meeshiis oo bur ah oo saliid
lagu daray oo qurbaan hadhuudh ah loo bixiyo, iyo log
saliid ah, **22** iyo laba qoolley ama laba xamaam oo yaryar,
kuwaas oo ah wax uu heli karo, oo middood waa inay
ahaato qurbaan dembi, midda kalena qurbaan la gubo. **23**
Oo waa inuu maalinta siddeedaad daahirintiisa aawadeed
wadaadka ugu keenaa iridda teendhada shirka agteeda oo
Rabbiga hortiisa ah. **24** Oo wadaadku markaas waa inuu
soo qaadaa wanka qurbaanka xadgudubka ah, iyo logga
saliidda ah, oo wadaadku waa inuu iyaga Rabbiga hortiisa
ugu ruxruxaa qurbaan la ruxruxo. **25** Oo waa inuu gowracaa
wanka qurbaanka xadgudubka ah, oo wadaadku waa inuu
dhiigga qurbaanka xadgudubka qaarkiis soo qaadaa, oo
taabsiiyaa kan la daahirinayo caaradda dhegtiisa midig, iyo
suulka gacantiisa midig, iyo suulka cagtiisa midigba. **26** Oo
waa in wadaadku saliidda ku shubaa calaacasha gacantiisa
bidix. **27** Oo waa inuu saliidda calaacashiisa bidix ku jirta
qaarkeed toddoba jeer fartiisa midig kula saydhaa Rabbiga
hortiisa. **28** Oo waa in wadaadku saliidda calaacashiisa
ku jirta qaarkeed taabsiiyaa kan la daahirinayo caaradda
dhegtiisa midig, iyo suulka gacantiisa midig, iyo suulka
cagtiisa midig, oo ha ka kor mariyo meeshii uu ku yiil dhiiggii
qurbaanka xadgudubku. **29** Oo saliidda wadaadka gacantiisa
ku jirta inteeda kalena waa inuu mariyaa kan la daahirinayo

madaxiisa, si uu isaga kafaaraggud ugu sameeyo Rabbiga
hortiisa. 30 Oo markaas waa inuu bixiyaa mid ka mid ah
qoolleyaha ama xamaamka yaryar, kuwaas oo ah wax uu
heli karo. 31 Oo xataa waxaas uu heli karo middood ha u
bixiyo qurbaan dembi, midda kalena qurbaan la gubo, oo
qurbaankii hadhuudhka la socda, oo wadaadku waa inuu kan
la daahirinayo kafaaraggud ugu sameeyaa Rabbiga hortiisa.
32 Kaasu waa sharciga ku saabsan qofkii cudurka baraska
ah qaba, oo aan awoodin inuu keeno wixii daahirintiisa
waajibka ku ahaa. 33 Markaasaa Rabbigu la hadlay Muuse
iyo Haaruun oo wuxuu ku yidhi, 34 Idinku markaad gashaan
dalka reer Kancaan oo aan hantida idiin siinayo, haddaan
cudurka baraska ah ku rido guri ku yaal dalka hantidiinna
ah, 35 markaas qofka guriga lahu waa inuu wadaadka u
yimaadaa oo u sheegaa isagoo leh, Waxay ila tahay in
cuduru guriga ku jiro. 36 Oo wadaadku waa inuu amraa
in guriga mid madhan laga dhigo, intaan wadaadku soo
gelin markuu cudurka fiirinayo, si aan waxa guriga ku jira
oo dhan nijaas looga dhigin, oo dabadeedna wadaadku
waa inuu galaa si uu guriga u fiiriyo. 37 Oo waa inuu
cudurka fiiriyaa, oo bal eeg, cudurku hadduu ku yaal guriga
derbiyadiisa oo ay leeyihiin meelo godgodan oo ah cagaar
iyo guduud, iyo haddii muuqashadiisu ay derbiga sare hoos u
sii dhaafsiisan tahay, 38 markaas waa in wadaadku gurigaas
ka baxo oo albaabka istaagaa, oo waa inuu gurigaas intii
toddoba maalmood ah xidhaa. 39 Oo haddana maalinta
toddobaad waa in wadaadku soo noqdaa oo fiiriyaa, oo bal
eeg, haddii cudurku ku sii faafay guriga derbiyadiisa, 40
markaas wadaadku waa inuu amraa in guriga laga bixiyo
dhagaxyada cudurka qaba, oo lagu xooraa meel nijaas ah
oo magaalada dibaddeeda ah. 41 Oo markaas waa inuu
ka dhigaa in guriga gudihiisa oo dhan la wada xoqo, oo
malaasta guriga laga xoqayna waa in lagu soo daadiyaa
meel nijaas ah oo magaalada dibaddeeda ah. 42 Oo waa
in dhagaxyo kale la soo qaadaa, oo la geliyaa meeshii
ay dhagaxyadaas laga bixiyey, oo malaas kale waa inuu
keenaa oo guriga ku malaasaa. 43 Oo haddii cudurku mar
kale guriga ku soo noqdo oo uu ka soo dhex baxo, markii
dhagaxyada laga bixiyey oo guriga oo dhan la xoqay oo la
malaasay dabadeed, 44 markaas wadaadku waa inuu soo
galaa, oo fiiriyaa, oo bal eeg, cudurku hadduu guriga ku
faafay, waa baras wax xagta oo guriga ku jira, oo markaas
gurigu waa nijaasaysan yahay. 45 Oo isagu waa inuu guriga
dumiyaa kulli dhagxantiisa, iyo alwaaxdiisa, iyo malaastiisa
oo dhanba, oo waa inuu magaalada dibaddeeda u bixiyaa,
oo meel nijaas ah ku daadiyaa. 46 Oo weliba gurigu intuu
xidhan yahay oo dhan ku alla kii galaaba, nijaas buu ahaan
doonaa tan iyo fiidkii. 47 Oo qofkii guriga seexdaaba waa
inuu dharkiisa maydhaa, oo kii guriga wax ku cunaana waa
inuu dharkiisa maydhaa. 48 Oo haddii wadaadku guriga
soo galo, oo uu fiiriyo, oo uu arko inaan cudurkii guriga ku
dhex faafin markii guriga la malaasay dabadeed, markaas
wadaadku waa inuu yidhaahdaa, Gurigu waa daahir, maxaa
yeelay, cudurkii wuu ka bogsaday. 49 Oo isna si uu guriga u
daahiriyo aawadeed waa inuu qaadaa laba shimbirrood,
iyo qori kedar ah, iyo wax casaan ah, iyo geed husob la
yidhaahdo. 50 Oo shimbirraha middood waa inuu ku dhex
gowracaa weel dhoobo ah oo biyo socda korkooda ah. 51
Oo isagu markaas waa inuu soo qaadaa qoriga kedarka ah,
iyo geedka husobka ah, iyo waxa casaanta ah iyo shimbirta
nool, oo iyaga waa inuu dhex geliyaa dhiigga shimbirtii la
gowracay iyo biyaha socdaba, oo markaas waa inuu toddoba
jeer guriga ku saydhsaydhaa. 52 Oo waa inuu guriga ku
daahiriyaa dhiigga shimbirta, iyo biyaha socda, iyo shimbirta
nool, iyo qoriga kedarka ah, iyo geedka husobka ah, iyo
waxa casaanta ah. 53 Laakiinse waa inuu shimbirta nool ku
sii daayaa berrin bannaan oo magaalada dibaddeeda ah,
oo sidaas waa inuu guriga kafaaraggud ugu sameeyaa, oo
markaasuu daahir ahaan doonaa. 54 Kanu waa sharciga
ku saabsan cayn kasta oo ah cudurka baraska ah, waana
cambaarta, 55 iyo weliba baraska dharka gala iyo kan guriga
galaba, 56 iyo bararka iyo qolofta, iyo barta dhalaalaysa. 57
Kanu waa sharciga baraska ku saabsan, oo idinkala baraya
markay wax nijaas yihiin iyo markay daahir yihiin.

**15** Markaasaa Rabbigu la hadlay Muuse iyo Haaruun oo
wuxuu ku yidhi, 2 Dadka reer binu Israa'iil la hadla
oo waxaad ku tidhaahdaan, Haddii qof leeyahay dheecaan
jidhkiisa ka soo dareero, dheecaankiisa aawadiis isagu
waa nijaas. 3 Oo nijaastiisuna sidanay ahaanaysaa inta
dheecaankiisu ka daadanayo. Haddii dheecaanku jidhkiisa ka
daadanayo iyo haddii dheecaanku jidhkiisa ka joogsadayba,
waa nijaastiisa. 4 Oo kan dheecaanku ka daadanayo sariir
alla sariirtii uu ku jiifsadaaba way nijaasoobaysaa, oo wax
alla wixii uu ku fadhiistaaba way nijaasoobayaan. 5 Oo ku alla
kii sariirtiisa taabtaaba waa inuu dharkiisa maydhaa, oo isna
biyo ku maydhaa, oo tan iyo fiidkiina nijaas buu ahaanayaa.
6 Oo ku alla kii ku fadhiisto wixii uu qofkii dheecaanku
ka daadanaya ku fadhiistay waa inuu dharkiisa maydhaa,
oo isna biyo ku maydhaa, oo tan iyo fiidkiina nijaas buu
ahaanayaa. 7 Oo kan dheecaanku ka daadanayo jidhkiisa
qofkii taabtaana waa inuu dharkiisa maydhaa, oo isna biyo
ku maydhaa, oo tan iyo fiidkiina nijaas buu ahaanayaa. 8 Oo
kan dheecaanku ka daadanayaana hadduu ku candhuufo qof

daahir ah, markaas ninkaasu waa inuu dharkiisa maydhaa, oo isna biyo ku maydhaa, oo tan iyo fiidkii nijaas buu ahaanayaa. **9** Oo kan dheecaanku ka daadanayo koore alla koorihii uu fuulaaba nijaas buu ahaanayaa. **10** Oo ku alla kii taabtaa wixii isaga hoostiisa ku jirayna, tan iyo fiidkii nijaas buu ahaanayaa, oo waxyaalahaas qofkii qaadaana waa inuu dharkiisa maydhaa, oo isna biyo ku maydhaa, oo tan iyo fiidkii nijaas buu ahaanayaa. **11** Oo kan dheecaanku ka daadanayo isagoo aan gacmihiisa biyo ku maydhin ku alla kii uu taabtaaba waa inuu dharkiisa maydhaa, oo isna biyo ku maydhaa, oo tan iyo fiidkii nijaas buu ahaanayaa. **12** Oo kan dheecaanku ka daadanayo weelkii dhoobo ah oo uu taabtona waa in la burburiyaa, oo weel kasta oo qori ahna waa in biyo lagu xalaa. **13** Oo kii dheecaanka daadanayaa markuu daahir ka noqdo, waa inuu toddoba maalmood nafsaddiisa u tirsadaa daahirintiisa aawadeed, oo dharkiisana waa inuu maydhaa, oo isna ku maydhaa biyo socda, oo markaasuu daahir ahaanayaa. **14** Oo maalinta siddeedaadna isagu waa inuu laba qoolley ama laba xamaam oo yaryar qaataa oo uu Rabbiga ugu hor yimaadaa iridda teendhada shirka, oo uu iyaga wadaadka u dhiibaa. **15** Oo wadaadku waa inuu middood u bixiyaa qurbaan dembi, midda kalena qurbaan la gubo, oo wadaadku waa inuu Rabbiga hortiisa kafaaraggud isaga ugu sameeyaa dheecaankiisa aawadiis. **16** Haddii nin shahwaddiisu ka timaada waa inuu jidhkiisa oo dhan biyo ku maydhaa, oo tan iyo fiidkii nijaas buu ahaanayaa. **17** Oo dhar kasta iyo harag kasta oo ay shahwaddiisu ku taalba, waa in biyo lagu maydhaa, oo tan iyo fiidkii nijaas bay ahaanayaan. **18** Oo weliba nin hadduu naag la seexdo, labadooduba waa inay biyo ku maydhaan, oo tan iyo fiidkii nijaas bay ahaanayaan. **19** Oo haddii dheecaan naag ka daadanayo, oo dheecaanka jidhkeeda ku yaal uu xayl yahay, iyadu waa inay intii toddoba maalmood ah nijaasteeda ku sii jirtaa. **20** Oo intay nijaasaysan tahay wax alla wixii ay ku jiifsataaba way nijaasoobayaan, oo wax alla wixii ay ku fadhiisataaba way nijaasoobayaan. **21** Oo ku alla kii sariirteeda taabtaana waa inuu dharkiisa maydhaa, oo isna biyo ku maydhaa, oo tan iyo fiidkiina nijaas buu ahaanayaa. **22** Oo wax alla wixii ay ku fadhiisato kii taabtaana waa inuu dharkiisa maydhaa, oo isna biyo ku maydhaa, oo tan iyo fiidkiina nijaas buu ahaanayaa. **23** Oo sariirteeda ama waxay ku fadhiisato haddii xayl ku yaal, markuu taabto, tan iyo fiidkii nijaas buu ahaanayaa. **24** Oo nin hadduu iyada la jiifsado oo xaylkeedu taabto intii toddoba maalmood ah nijaas buu ahaanayaa, oo sariir alla sariirtii uu ku jiifsadaaba way nijaasoobaysaa. **25** Haddii naag uu ka daato dheecaan dhiiggeeda ah maalmo badan oo aan ahayn wakhtigii xaylkeeda, ama hadduu iyada ka daato dheecaan ka badan oo dhaafsiisan wakhtigii xaylkeeda, inta iyada dheecaanku ka daadanayo oo ay nijaasaysan tahay oo dhan waa inay ahaataa sidii maalmihii ay xaylka qabtay oo kale, waayo, way nijaasaysan tahay. **26** Oo inta dheecaanku iyada ka daadanayo oo dhan, sariir alla sariirtii ay ku jiifsataaba, waxay iyada u ahaan doontaa sida sariirta ay ku jiifsato markay xaylka qabto, oo wax alla wixii ay ku fadhiisataaba waxay u nijaasoobayaan sida nijaasta xaylkeeda. **27** Oo waxyaalahaas ku alla kii taabtaa wuu nijaasoobayaa, oo waa inuu dharkiisa maydhaa, oo isna biyo ku maydhaa, oo tan iyo fiidkii nijaas buu ahaanayaa. **28** Laakiinse hadday dheecaankeedii ka daahirsanaato, markaas waa inay toddoba maalmood nafsaddeeda u tirsataa, oo markaas dabadeedna daahir bay ahaanaysaa. **29** Oo maalinta siddeedaadna waa inay laba qoolley ama laba xamaam oo yaryar qaadataa oo ay wadaadka ugu keentaa iridda teendhada shirka. **30** Oo wadaadku waa inuu middood u bixiyaa qurbaan dembi, oo midda kalena qurbaan la gubo, oo wadaadku waa inuu iyada kafaaraggud ugu sameeyaa Rabbiga hortiisa dheecaankii nijaasteeda aawadiis. **31** Oo sidaas waa inaad reer binu Israa'iil nijaastooda uga soocdaan, si ayan nijaastooda ugu dhex dhiman markay nijaaseeyaan taambuuggayga dhexdooda ku yaal. **32** Kanu waa sharciga ku saabsan kii dheecaan ka daadanayo iyo kii shahwaddiisu ka timaado, oo uu sidaas ku nijaasoobay, **33** iyo naagtii xayl qabta, iyo qofkii dheecaan ka daadanayo nin iyo naag miduu yahayba, iyo kii la seexda tii nijaasaysan.

**16** Oo markii Haaruun labadiisii wiil ay Rabbiga hortiisa u soo dhowaadeen oo ay dhinteen dabadeed ayaa Rabbigu Muuse la hadlay, **2** oo wuxuu Muuse ku yidhi, Walaalkaa Haaruun la hadal si uusan goor walba u soo gelin meesha quduuska ah oo ilxidhka ka shishaysa gudaheeda, oo ka soo hor jeedda daboolka sanduuqa kor saaran, yuusan dhimane, waayo, anigu waxaan ka dhex muuqan doonaa daruurta kor saaran daboolka. **3** Haddaba Haaruun meesha quduuska ah waa inuu la soo galo dibi yar oo qurbaan dembi ah, iyo wan qurbaan la gubo ah. **4** Waa inuu gashadaa jubbadda quduuska ah oo dhar linen ah laga sameeyey, oo waa inuu jidhkiisa u lebbisaa sirwaalka linenka ah, oo dhexdana waa inuu ku xidhaa dhex-xidhka linenka ah, oo duubka linenka ahna waa inuu madaxa ku duubtaa, waayo, iyagu waa dharka quduuska ah oo intuu jidhkiisa biyo ku maydho waa inuu dharkaas lebbistaa. **5** Oo ururka reer binu Israa'iilna waa inuu laba orgi uga soo qaadaa qurbaan dembi, wanna qurbaan la gubo. **6** Oo Haaruun waa inuu keenaa dibiga qurbaanka dembiga ah oo uu nafsaddiisa u bixinayo,

oo waa inuu nafsaddiisa iyo reerkiisaba kafaaraggud u
sameeyaa. 7 Oo waa inuu labada orgi soo kexeeyaa, oo uu
soo taagaa meel Rabbiga hortiisa ah oo iridda teendhada
shirka u dhow. 8 Oo markaas Haaruun waa inuu labada
orgi saami u kala ridaa, oo saami kan Rabbiga ha ahaado,
saamiga kalena kan Casaaseel ha ahaado. 9 Oo orgigii
saamigu ugu dhacay Rabbiga, Haaruun waa inuu keenaa,
oo qurbaan dembi u bixiyaa. 10 Laakiinse orgigii saamigu
ugu dhacay Casaaseel waa in isagoo nool Rabbiga hortiisa
la taagaa si kafaaraggud looga kor sameeyo, oo Casaaseel
aawadiis cidlada loogu eryo. 11 Oo Haaruun waa inuu keenaa
dibiga qurbaanka dembiga ah oo uu nafsaddiisa u bixinayo,
oo waa inuu nafsaddiisa iyo reerkiisaba kafaaraggud u
sameeyaa, oo uu gowracaa dibiga qurbaanka dembiga ah oo
uu nafsaddiisa u bixinayo. 12 Oo waa inuu meesha allabariga
ee Rabbiga hortiisa taal ka qaadaa idan ay dhuxulo noolu
ka buuxaan, oo waa inuu sacabbadiisana ka buuxsadaa
foox udgoon oo tuman, oo uu ilxidhka la galaa. 13 Oo waa
inuu fooxa ku shubaa dabka Rabbiga hortiisa yaal, si fooxa
qiiqiisu u qariyo daboolka sanduuqa markhaatiga kor saaran,
yuusan dhimane. 14 Oo isagu waa inuu qaadaa dhiiggii
dibiga qaarkiis, oo fartiisa ha kula saydhsaydho daboolka
dhankiisa bari, oo daboolka hortiisana waa inuu dhiigga
fartiisa kula saydhsaydhaa toddoba jeer. 15 Markaas waa
inuu gowracaa orgigii dadka loogu bixinayo qurbaan dembi,
oo uu dhiiggiisana ilxidhka soo geliyaa, oo orgiga dhiiggiisana
waa inuu ku sameeyaa siduu ku sameeyey dhiiggii dibiga
oo kale, oo uu ku saydhsaydhaa daboolka dushiisa iyo
hortiisaba. 16 Oo isagu waa inuu meesha quduuska ah
daraaddeed kafaaraggud ugu sameeyaa dadka reer binu
Israa'iil waxyaalahooda nijaasta ah iyo xadgudubyadooda oo
ah xataa dembiyadooda oo dhan aawadood, oo sidaasoo
kalena waa inuu u sameeyaa teendhada shirka oo iyaga
la deggan waxyaalahooda nijaasta ah dhexdooda. 17 Oo
waa inaan ninna teendhada shirka joogin markii uu isagu
u galo inuu kafaaraggud ku sameeyo meesha quduuska
ah gudaheeda ilaa uu ka soo baxo, isagoo kafaaraggud
u sameeyey nafsaddiisa, iyo reerkiisa, iyo shirka reer
binu Israa'iil oo dhan. 18 Oo waa inuu meesha allabariga
ee Rabbiga hortiisa taal u baxaa, oo uu kafaaraggud u
sameeyaa, oo uu soo qaadaa dhiigga dibiga qaarkiis, iyo
dhiigga orgiga qaarkiis, oo uu mariyaa meesha allabariga
geesaheeda. 19 Oo waa inuu toddoba jeer dhiigga fartiisa
kula saydhaa meesha allabariga, oo waa inuu daahiriyaa,
oo quduus ka dhigaa waxyaalaha nijaasta ah ee reer binu
Israa'iil. 20 Oo markuu dhammaystiro kafaaraggudka uu u
samaynayo meesha quduuska ah, iyo teendhada shirka,
iyo meesha allabarigaba waa inuu orgiga nool keenaa.
21 Oo markaas Haaruun waa inuu labadiisa gacmoodba
kor saaraa madaxa orgiga nool, oo waa inuu korkiisa
ku qirtaa xumaatooyinkii reer binu Israa'iil oo dhan iyo
xadgudubyadoodii oo dhan, oo ah xataa dembiyadoodii
oo dhan, oo waxaas oo dhan waa inuu kor saaraa orgiga
madaxiisa, dabadeedna waa inuu cidlada ugu diraa nin
diyaarsan. 22 Oo orgiguna xumaatooyinkoodii oo dhan wuxuu
u qaadayaa dhul cidla ah, oo markaas waa inuu orgiga
ku sii daayaa cidlada dhexdeeda. 23 Markaas Haaruun
waa inuu teendhada shirka galaa, oo waa inuu iska furaa
dharka wanaagsan oo linenka ah, oo uu gashaday markuu
galay meesha quduuska ah, oo waa inuu dharka halkaas
kaga tagaa, 24 oo waa inuu meel quduus ah ku maydhaa,
oo uu dharkiisii soo gashadaa, oo dibadda u soo baxaa,
oo bixiyaa qurbaankiisii la gubayo iyo qurbaankii dadka
oo la gubayoba, oo kafaaraggudna waa inuu u sameeyaa
nafsaddiisa iyo dadka daraaddiisba. 25 Oo xaydha qurbaanka
dembigana waa inuu meesha allabariga ku dul gubaa. 26
Oo kii Casaaseel orgiga u sii daayayna waa inuu dharkiisa
maydhaa, oo jidhkiisana biyo ku maydhaa, oo dabadeedna
xerada galaa. 27 Oo dibigii qurbaanka dembiga ahaa, iyo
orgigii qurbaanka dembiga ahaa oo dhiiggooda loo soo
geliyey meesha quduuska ah in kafaaraggud lagu sameeyo,
waa in xerada dibadda looga bixiyaa, oo haraggooda iyo
hilibkooda iyo uuskoodaba dabka lagu gubaa. 28 Oo qofkii
iyaga gubaana dharkiisa waa inuu maydhaa, oo jidhkiisana
biyo ku maydhaa, oo dabadeedna xerada soo galaa. 29 Oo
waxaa weligiinba qaynuun idiin ahaan doona inaad bisha
toddobaad maalinteeda tobnaad nafihiinna dhibtaan, oo waa
inaydaan waxba shuqul qaban cayn kasta ha ahaadee,
kiinna waddaniga ah iyo shisheeyaha dhexdiinna degganuba,
30 waayo, maalintaas kafaaraggud baa laydiin samayn
doonaa in laydin daahiriyo aawadeed, oo dembiyadiinna
oo dhanna daahir baad kaga noqon doontaan Rabbiga
hortiisa. 31 Maalintaasu waxay idiin tahay sabti nasasho
weyn leh, oo waa inaad nafihiinna dhibtaan. Taasu waa
qaynuun weligiis jira. 32 Oo wadaadka la subki doono oo
quduus looga dhigi doono inuu wadaad ka ahaado meeshii
aabbihiis ayaa kafaaraggudka samayn doona, oo isagaa
xidhan doona dharka wanaagsan oo linenka ah, oo ah
dharka quduuska ah. 33 Oo isagu waa inuu kafaaraggud u
sameeyaa meesha quduuska ah, waana inuu kafaaraggud
u sameeyaa teendhada shirka iyo meesha allabariga, oo
waa inuu kafaaraggud u sameeyaa wadaaddada iyo dadka
shirka oo dhan. 34 Oo kaasu qaynuun weligiis ah buu idiin
ahaan doonaa inaad reer binu Israa'iil sannaddiiba mar

kafaaraggud ugu samaysaan dembiyadooda oo dhan. Oo
isna wuxuu sameeyey sidii Rabbigu Muuse ku amray.

**17** Markaasaa Rabbigu Muuse la hadlay oo wuxuu ku yidhi,
2 Waxaad la hadashaa Haaruun, iyo wiilashiisa, iyo
dadka reer binu Israa'iil oo dhan, oo waxaad ku tidhaahdaa,
Waxanu waa wixii Rabbigu amray, oo uu yidhi, 3 Nin kasta
oo reer binu Israa'iil ka mid ah, oo xerada gudaheeda ama
dibaddeeda ku gowraca dibi ama wan yar ama orgi, 4
isagoo aan iridda teendhada shirka keenin inuu Rabbiga
qurbaan ahaan ugu bixiyo taambuugga Rabbiga hortiisa,
ninkaas waxaa lagu xisaabi doonaa mid uu dhiig saaran
yahay, waayo, isagu dhiig buu daadiyey, oo qofkaas waa in
dadkiisa dhexdooda laga gooyaa, 5 oo sidaas daraaddeed
reer binu Israa'iil waa inay keenaan allabaryadooda ay
berrinka bannaan ku bixiyaan, oo iyagu waa inay Rabbiga
ugu keenaan iridda teendhada shirka, waana inay wadaadka
guddoonsiiyaan, oo ay Rabbiga ugu bixiyaan allabaryo
qurbaanno nabaadiino ah. 6 Oo wadaadkuna waa inuu
dhiigga ku saydhsaydhaa meesha allabariga ee Rabbiga
oo ag yaal iridda teendhada shirka, oo xaydhana waa inuu
gubaa si ay Rabbiga u ahaato caraf udgoon. 7 Oo iyagu
waa inayan mar dambe allabaryadooda u bixin orgiyada
ay caabudaan sida naagu ninkeeda uga dhillowdo. Kaasu
qaynuun weligiis ah buu ab ka ab u ahaan doonaa iyaga. 8
Oo waxaad iyaga ku tidhaahdaa, Nin kasta oo ka mid ah
reer binu Israa'iil ama shisheeyayaasha dhexdooda deggan,
oo bixiya qurbaan la gubo ama allabari, 9 isagoo aan keenin
iridda teendhada shirka inuu Rabbiga u bixiyo daraaddeed,
ninkaas waa in dadkiisa laga gooyaa. 10 Oo nin alla ninkii ka
mid ah reer binu Israa'iil ama shisheeyayaasha dhexdooda
deggan oo cuna cayn kasta oo dhiig ah, aniga ayaa ka
gees noqon doonaa qofkaas dhiigga cuna, oo dadkiisaan
isaga ka gooyn doonaa. 11 Waayo, jiidhka noloshiisii waxay
ku dhex jirtaa dhiigga; oo anna waxaan meesha allabariga
dusheeda idiinku siiyey in nafihiinna loogu kafaaro gudo,
waayo, waa dhiigga waxa loogu kafaaro gudaa nolosha
daraaddeed. 12 Haddaba sidaas daraaddeed waxaan reer
binu Israa'iil ku idhi, Qof idinka mid ahu waa inuusan dhiig
cunin, oo shisheeyaha idin dhex degganuna waa inuusan
dhiig cunin. 13 Oo nin alla ninkii ka mid ah reer binu
Israa'iil ama shisheeyayaasha dhexdooda deggan hadduu
ugaadhsasho ku helo neef amase haad ugaadh ah oo la
cuno, waa inuu dhiiggiisa daadiyaa oo ciid ku daboolaa. 14
Waayo, jiidh kastaba naftiisa iyo dhiiggiisu waa isku mid
qudha, oo sidaas daraaddeed ayaan reer binu Israa'iil ku
idhi, Waa inaydaan jiidhnaba dhiiggiisa cunin cayn kastoo uu
yahayba, waayo, jiidh kastaba noloshiisu waa dhiiggiisa,
oo qof alla qofkii dhiig cunaba waa la gooyn doonaa. 15
Oo qof kasta oo cuna neef iska bakhtiyey amase neef
dugaagu bakhtiistay, hadduu yahay waddani iyo hadduu
shisheeye yahayba waa inuu dharkiisa maydhaa, oo isna
biyo ku maydhaa, oo tan iyo fiidkana nijaas buu ahaanayaa,
oo dabadeedna daahir buu ahaan doonaa. 16 Laakiinse
hadduusan dharkiisa maydhin ama uusan jidhkiisa maydhin,
markaasuu dembigiisa qaadan doonaa.

**18** Markaasaa Rabbigu Muuse la hadlay oo wuxuu ku yidhi,
2 Reer binu Israa'iil la hadal oo waxaad ku tidhaahdaa,
Anigu waxaan ahay Rabbiga Ilaahiinna ah. 3 Falimaha dalka
Masar ee aad degganaan jirteen waa inaydaan samayn,
oo falimaha dalka Kancaan oo aan idiin geeynayana waa
inaydaan samayn, oo qaynuunnadoodana waa inaydaan
ku socon. 4 Waxaad samaysaan xukummadayda, oo
waxaad dhawrtaan qaynuunnadayda si aad iyaga ugu dhex
socotaan, waayo, aniga ayaa ah Rabbiga Ilaahiinna ah. 5
Haddaba sidaas daraaddeed idinku waa inaad dhawrtaan
qaynuunnadayda iyo xukummadayda, oo ninkii sameeyaana
iyaguu ku noolaan doonaa, waayo, aniga ayaa Rabbiga
ah. 6 Waa inaan midkiinna u dhowaan qof ka mid ah
xigaalkiisa u dhow inuu cawradiisa qaawiyo, waayo, aniga
ayaa Rabbiga ah. 7 Cawrada aabbahaa taasoo ah cawrada
hooyadaa waa inaadan qaawin, iyadu waa hooyadaa, ee
waa inaadan cawradeeda qaawin. 8 Oo waa inaadan qaawin
cawrada naagta aabbahaa, ee waa cawradii aabbahaa. 9
Waa inaadan qaawin cawrada walaashaa oo ah aabbahaa
gabadhiisa ama hooyadaa gabadheeda, hadday guriga
ku dhalatay iyo hadday meel kale ku dhalatayba. 10 Waa
inaadan qaawin cawrada gabadha wiilkaaga, ama cawrada
gabadha gabadhaada, waayo, toodu waa cawradaadii. 11
Waa inaadan qaawin cawrada naagta aabbahaa gabadheeda
ay aabbahaa u dhashay, waayo, iyadu waa walaashaa,
ee waa inaadan cawradeeda qaawin. 12 Waa inaadan
qaawin cawrada eeddadaa, waayo, iyadu waa aabbahaa
qaraabadiis u dhow. 13 Waa inaadan qaawin cawrada
habaryartaa, waayo, iyadu waa hooyadaa qaraabadeed u
dhow. 14 Waa inaadan adeerkaa cawradiisa qaawin. Waa
inaadan naagtiisa u dhowaan, waayo, iyadu waa aayadaa.
15 Waa inaadan qaawin cawrada gabadha aad soddogga u
tahay, waayo, iyadu waa naagtii wiilkaaga, ee waa inaadan
cawradeeda qaawin. 16 Waa inaadan qaawin cawrada
naagta walaalkaa, waayo, taasu waa cawradii walaalkaa. 17
Waa inaadan naag iyo gabadheedaba cawradooda wada
qaawin, oo waa inaadan kaxaysan gabadha wiilkeeda ama
gabadha gabadheeda si aad cawradeeda u qaawisid; waayo,

iyagu waa naago qaraabo kuu dhow ah, oo taasu waa
shar. 18 Waa inaadan naagtaada walaasheed la guursan
oo aadan cawradeeda qaawin intay naagtaadu nooshahay.
19 Waa inaadan naag u dhowaan si aad cawradeeda u
qaawisid, in alla intay xaylka ku nijaasaysan tahay. 20 Waa
inaadan la jiifsan naagta deriskaaga, si aadan iyada ugu
nijaasoobin. 21 Waa inaadan carruurtaada Moleg siin oo
aadan iyaga innaba dab u dhex marsiin, oo weliba waa
inaadan magaca Ilaahaaga hadal nijaas ah ka sheegin,
waayo, aniga ayaa Rabbiga ah. 22 Waa inaadan ragga ula
seexan sida dumarka loola seexdo oo kale, waayo, taasu
waa karaahiyo. 23 Waa inaadan neef xayawaan ah kudin
si aadan ugu nijaasoobin, oo naaguna waa inayan neef
xayawaan ah is-hor taagin si ay isaga ugu jiifsato, waayo,
taasu waa qasnaan. 24 Idinku waxyaalahaas midkoodna
nafsaddiinna ha ku nijaasaynina, waayo, quruumihii aan
hortiinna ka eryay oo dhammu waxyaalahaas bay ku
nijaasoobeen, 25 oo dalkii wuu nijaasoobay, haddaba sidaas
daraaddeed ayaan xumaantiisii soo gaadhsiinayaa, oo dalku
waa mantagayaa dadka deggan. 26 Haddaba idinku waa
inaad dhawrtaan qaynuunnadayda iyo xukummadayda,
oo waa inaydaan waxyaalahaas karaahiyada ah innaba
samayn, kiinnii waddani ah, iyo kii shisheeye ah oo idin dhex
degganuba, 27 (waayo, dadkii dalka degganaan jiray oo
idinka horreeyey waxyaalahaas karaahiyada ah oo dhan ayay
wada samayn jireen, oo dalkuna wuu nijaasoobay; ) 28 si
markaad nijaasaysaan dalku uusan idinkana idiin mantagin,
siduu quruuntii idinka horraysay u mantagay oo kale. 29
Waayo, ku alla kii sameeya waxyaalahaas karaahiyada ah,
xataa nafihii waxyaalahaas sameeya dadkooda waa laga
gooyn doonaa. 30 Haddaba sidaas daraaddeed waa inaad
amarkayga xajisaan si aydaan u samayn oo aydaan ugu
nijaasoobin caadooyinkaas karaahiyada ah oo dadkii idinka
horreeyey ay samayn jireen, waayo, aniga ayaa ah Rabbiga
Ilaahiinna ah.

**19** Markaasaa Rabbigu Muuse la hadlay oo wuxuu ku
yidhi, 2 La hadal ururka reer binu Israa'iil oo dhan, oo
waxaad ku tidhaahdaa, Waa inaad quduus ahaataan, waayo,
anigoo ah Rabbiga Ilaahiinna ahuba quduus baan ahay. 3 Oo
idinka midkiin kastaaba waa inuu ka cabsadaa aabbihiis iyo
hooyadiis, oo waa inaad dhawrtaan maalmahayga sabtida
ah, waayo, aniga ayaa ah Rabbiga Ilaahiinna ah. 4 Sanamyo
ha u jeesanina, oo hana samaysanina ilaahyo la tumay,
waayo, aniga ayaa ah Rabbiga Ilaahiinna ah. 5 Oo markaad
allabari qurbaanno nabaadiino ah Rabbiga u bixinaysaan waa
inaad bixisaan si laydiin aqbalo. 6 Oo waa in dhammaantiis la
wada cunaa maalinta aad bixisaan iyo maalinta ku xigta, oo
haddii wax ka hadhaan oo ay gaadhaan maalinta saddexaad
waa in dab lagu gubaa. 7 Oo innaba haddii maalinta
saddexaad la cuno waa karaahiyo, oo la aqbali maayo, 8 ku
alla kii cunaase dembigiisuu qaadanayaa, maxaa yeelay,
nijaas buu ka dhigay Rabbiga wixiisii quduuska ahaa, oo
qofkaasna dadkiisa waa laga gooyn doonaa. 9 Oo markaad
goosataan waxa dhulkiinna ka soo baxa waa inaydaan
midhaha ka wada goosan rukummada beertiinna, oo weliba
waa inaydaan soo urursan xaaxaabka beergoosadkiinna. 10
Oo beertiinna canabka ahna waa inaydaan xaaxaabin, oo
midhaha beertiinna canabka ah oo dhacayna waa inaydaan
soo urursan, laakiinse waa inaad u daysaan miskiinka iyo
shisheeyaha, waayo, aniga ayaa ah Rabbiga Ilaahiinna ah.
11 Waa inaydaan waxba xadin, oo aydaan daacadla'aan
ku isticmaalin, waana inaan midkiinna midka kale been u
sheegin. 12 Oo waa inaydaan magacayga been ugu dhaaran,
yeydnan hadal nijaas ah ka sheegin magaca Ilaahiinna,
waayo, aniga ayaa Rabbiga ah. 13 Waa inaadan deriskaaga
dulmin, waana inaadan waxba ka dhicin. Oo shaqaale aad
soo kiraysatay mushahaaradiisu yaanay habeenkii kugu
baryin oo kugu gaadhin tan iyo subaxda dambe. 14 Waa
inaadan caayin qofkii dhega la', oo kii indha la'na waa
inaadan hortiisa dhigin wax lagu turunturoodo, laakiinse waa
inaad Ilaahaaga ka cabsataa, waayo, aniga ayaa Rabbiga ah.
15 Waa inaydaan garsooridda caddaaladdarro ku samayn,
oo waa inaadan miskiinka u eexan, ama aadan cisayn
qofka weyn, laakiinse deriskaaga waxaad ugu garsoortaa si
caddaalad ah. 16 Waa inaadan dadkaaga xan kula dhex
wareegin, oo waa inaadan deriskaaga dhiiggiisa hor joogsan,
waayo, aniga ayaa Rabbiga ah. 17 Waa inaadan walaalkaa
qalbiga ka nebcaan, oo sida xaqiiqada ah waa inaad
deriskaaga canaanataa, yaadan isaga daraaddiis dembi u
qaadane. 18 Waa inaadan ninna ka aarsan, waana inaadan
dadkaaga u ciil qabin, laakiinse waa inaad deriskaaga u
jeclaataa sidaad naftaada u jeceshahay oo kale, waayo,
aniga ayaa Rabbiga ah. 19 Waa inaad qaynuunnadayda
dhawrtaan. Waa inaadan xoolahaaga u dayn inay cayn kale
ku beermaan, oo waa inaadan beertaada ku beeran midho
laba cayn ah, oo waa inaadan xidhan dhar laga sameeyey
laba cayn oo isku darsan. 20 Oo ku alla kii la seexda naag
addoon ah oo nin u doonan, oo aan la madax furin ama
aan la xorayn, markaas waa in iyaga la ciqaabaa, laakiinse
waa inaan iyaga la dilin, maxaa yeelay, iyadu xor ma ay
ahayn. 21 Oo isagu waa inuu qurbaankiisii xadgudubka,
kaasoo ah wan ah qurbaan xadgudub, Rabbiga ugu keenaa
iridda teendhada shirka. 22 Oo wadaadku waa inuu isaga

kafaaraggud uga dhigaa wanka qurbaanka xadgudubka
ah, oo waa inuu Rabbiga hortiisa ugu bixiyaa dembiguu
dembaabay aawadiis, oo isagana waa laga cafiyi doonaa
dembigii uu dembaabay. 23 Oo markaad dalka gashaan, oo
aad cunto u beerataan dhir cayn kasta ah, markaas waa
inaad midhahooda ku tirisaan sidii wax buuryoqab ah, oo
intii saddex sannadood ah waxay idiin ahaan doonaan sidii
wax buuryoqab ah, oo waa inaan midhahaas la cunin. 24
Laakiinse sannadda afraad midhahooda oo dhammu quduus
bay ahaan doonaan, si Rabbiga loo ammaano aawadeed.
25 Oo midhahoodana waxaad cuni doontaan sannadda
shanaad, si ay midhahoodu idiinku soo baxaan, waayo,
aniga ayaa ah Rabbiga Ilaahiinna ah. 26 Waa inaydaan
wax dhiiggoodu ku jiro cunin, oo waa inaydaan u tegin
falanfallowyo ama aydaan faalna ku noqnoqon. 27 Waa
inaydaan timaha madaxa ka jaran dhinacyada, gadhkiinnana
waa inaydaan jarin. 28 Waa inaydaan jidhkiinna u gooyn qof
dhintay daraaddiis, ama waa inaydaan waxba ku daabicin,
waayo, aniga ayaa Rabbiga ah. 29 Waa inaadan gabadhaada
nijaasayn oo aadan dhillo ka dhigin, waaba intaasoo uu
dalku noqdaa sino miidhan oo uu shar ka buuxsamaa. 30
Waa inaad maalmahayga sabtida ah dhawrtaan, oo aad
meeshayda quduuska ah maamuustaan, waayo, aniga ayaa
Rabbiga ah. 31 Ha u jeesanina xagga kuwa ruuxaanta
leh, iyo saaxiriinta, oo iyaga ha doondoonina yeydnan
nijaasoobine, waayo, aniga ayaa ah Rabbiga Ilaahiinna ah.
32 Waa inaad qofkii cirro leh u istaagtaa, oo waa inaad ninkii
oday ah cisaysaa, waana inaad Ilaahaa ka cabsataa, waayo,
aniga ayaa Rabbiga ah. 33 Oo haddii mid shisheeye ahu
idinla deggan yahay dhulkiinna, waa inaydaan xumayn. 34
Shisheeyaha idinla degganu waa inuu idiinla mid ahaadaa
sida waddaniga idin dhex jooga, oo waa inaad isaga u
jeclaataan sidaad naftiinna u jeceshihiin oo kale, maxaa
yeelay, idinkuba shisheeyayaal baad ku ahaan jirteen dalkii
Masar, waayo, aniga ayaa ah Rabbiga Ilaahiinna ah. 35 Waa
inaydaan xaqdarro ka samayn garsooridda, iyo cabbiridda,
iyo miisaamidda iyo beegiddaba. 36 Waa inaad haysataan
kafado qumman iyo miisaan qumman, iyo eefaah qumman
iyo hiin qumman, waayo, aniga ayaa ah Rabbiga Ilaahiinna
ah oo dalkii Masar idinka soo bixiyey. 37 Oo waa inaad
wada dhawrtaan oo yeeshaan qaynuunnadayda oo dhan iyo
xukummadayda oo dhan, waayo, aniga ayaa Rabbiga ah.

**20** Markaasaa Rabbigu Muuse la hadlay oo wuxuu ku
yidhi, 2 Weliba waxaad ku tidhaahdaa reer binu Israa'iil,
Ku alla kii reer binu Israa'iil ka mid ah, ama shisheeyayaasha
idin dhex deggan ka mid ah, oo carruurtiisa Moleg siiya, sida
xaqiiqada ah kaas waa in la dilaa, oo dadka dalka degganu
waa inay dhagax la dhacaan. 3 Oo anna qofkaas ayaan ka
gees noqon doonaa, oo isagaan dadkiisa ka dhex gooyn
doonaa, maxaa yeelay, wuxuu carruurtiisii siiyey Moleg, oo
sidaasuu meeshayda quduuska ah ku nijaaseeyey oo uu
magacayga quduuska ahna wax nijaas ah kaga sheegay. 4
Oo haddii dadka dalka degganu ay ninkaas indhahooda ka
qarsadaan oo ayan isaga dilin markuu carruurtiisa Moleg
siiyo, 5 markaas aniga ayaa ninkaas iyo reerkiisaba ka gees
noqon doonaa, oo isaga iyo in alla intii raacda inay Moleg u
daba galaan sida naagu ninkeeda uga dhillowdo, waxaan ka
dhex gooyn doonaa dadkooda. 6 Oo qof alla qofkii u jeesta
xagga kuwa ruuxaanta leh iyo saaxiriinta, oo iyaga u daba
gala sida naagu ninkeeda uga dhillowdo, sida xaqiiqada ah
anigu qofkaas ayaan ka gees noqon doonaa oo isagaan
dadkiisa ka dhex gooyn doonaa. 7 Haddaba isdaahiriya oo
quduus ahaada, waayo, aniga ayaa ah Rabbiga Ilaahiinna ah.
8 Oo waa inaad qaynuunnadayda dhawrtaan oo yeeshaan,
waayo, anigu waxaan ahay Rabbiga quduus idinka dhiga. 9
Oo ku alla kii caaya aabbihiis ama hooyadiis, sida xaqiiqada
ah waa in la dilaa, waayo, wuxuu caayay aabbihiis ama
hooyadiis, oo dhiiggiisuna isaguu dul saarnaan doonaa. 10
Oo nin alla ninkii ka sinaysta nin kale naagtiis, kaasoo ah kii
ka sinaysta naagta deriskiisa, sida xaqiiqada ah dhillayga
iyo dhilladaba waa in la dilaa. 11 Oo ninkii naagta aabbihiis
la seexdaana wuxuu qaawiyey cawradii aabbihiis, oo sida
xaqiiqada ah labadoodaba waa in la dilaa; oo dhiiggooduna
iyaguu dul saarnaan doonaa. 12 Oo haddii nin la seexdo
gabadh uu soddog u yahay, sida xaqiiqada ah labadoodaba
waa in la dilaa; iyagu waxay sameeyeen wax qas ah, oo
dhiiggooduna iyaguu dul saarnaan doonaa. 13 Oo haddii
nin nin kaleeto ula seexdo sida dumarka loola seexdo oo
kale, labadooduba waxay sameeyeen karaahiyo oo sida
xaqiiqada ah waa in iyaga la dilaa, oo dhiiggooduna iyaguu
dul saarnaan doonaa. 14 Oo haddii nin wada guursado naag
iyo hooyadeed, taasu waa shar, oo isaga iyo labadoodaba
waa in dhammaantood dab lagu gubaa, si aan sharu idiinku
dhex jirin. 15 Oo haddii nin neef xayawaan ah kudo, sida
xaqiiqada ah waa in ninkaas la dilaa, oo neefkana waa
inaad gowracdaan. 16 Oo naaguna hadday u dhowaato
neef xayawaan ah, oo ay u jiifsato, naagta iyo neefkaba
waa inaad dishaan, sida xaqiiqada ah waa in labadoodaba
la dilaa; oo dhiiggooduna iyaguu dul saarnaan doonaa.
17 Oo haddii nin kaxaysto walaashiis oo ah ina aabbihiis
ama ina hooyadiis, oo uu cawradeeda arko, oo iyana ay
cawradiisa aragto, taasu waa wax ceeb ah, oo iyaga waa
in dadkooda hortiisa laga gooyaa, waayo, isagu wuxuu
qaawiyey cawradii walaashiis, oo dembigiisana wuu qaadan

doonaa. 18 Oo haddii nin la seexdo naag xayl qabta, oo
uu cawradeeda qaawiyo, wuxuu qaawiyey ishii dhiiggeeda
oo iyana waxay qaawisay ishii dhiiggeeda, oo markaas
labadoodaba waa in laga gooyaa dadkooda. 19 Oo waa
inaadan qaawin habaryartaa, ama eeddadaa, waayo, kii
saas yeelaa wuxuu qaawiyey xigaalkiisa u dhow, oo iyagu
waxay qaadan doonaan dembigooda. 20 Oo haddii nin la
seexdo naagta adeerkiis, kaasu wuxuu qaawiyey cawradii
adeerkiis; iyagu waxay qaadan doonaan dembigooda, oo
waxay dhiman doonaan iyagoo gablan ah. 21 Oo haddii nin
kaxaysto naagta walaalkiis, taasu waa nijaas, waayo, wuxuu
qaawiyey cawradii walaalkiis, oo iyagu waxay ahaan doonaan
gablan. 22 Haddaba waa inaad wada xajisaan oo yeeshaan
qaynuunnadayda oo dhan iyo xukummadayda oo dhan, si
dalka aan idin geeynayo inaad degtaan uusan idiin mantagin.
23 Oo waa inaydaan ku socon caadooyinkii quruuntii aan
hortiinna ka eryayo, waayo, iyagu waxyaalahaas oo dhan
ayay samayn jireen, oo sidaas daraaddeed ayaan u karhay.
24 Laakiinse waxaan idinku idhi, Idinka ayaa dalkoodii dhaxli
doona, oo hanti ahaan ayaan idiin siinayaa, kaasoo ah
dal caano iyo malab la barwaaqaysan, waayo, aniga ayaa
ah Rabbiga Ilaahiinna ah oo idinka soocay dadyowga. 25
Haddaba sidaas daraaddeed waa inaad kala soocdaan
xayawaanka daahirka ah iyo kan nijaasta ah, iyo haadda
daahirka ah iyo tan nijaasta ah, oo waa inaydaan nafihiinna
wax karaahiyo ah kaga dhigin xayawaan ama haad ama
waxa dhulka ku gurguurta oo aan idinka soocay oo aan
idhi, Waa nijaas. 26 Waa inaad quduus ii ahaataan, waayo,
anigoo Rabbiga ahuba quduus baan ahay, oo dadyowgii
baan idinka soocay, si aad kuwaygii u ahaataan. 27 Oo
weliba sida xaqiiqada ah waa in la dilaa ninkii ama naagtii
ruuxaan leh, ama ku alla kii saaxir ah, oo iyaga waa in
dhagax la dhacaa, oo dhiiggooduna iyaguu dul saarnaan
doonaa.

21 Markaasaa Rabbigu Muuse ku yidhi, La hadal
wadaaddada ah wiilashii Haaruun, oo waxaad ku
tidhaahdaa, Ninkiinna yuusan isu nijaasayn mid dadkiisa ah
oo dhintay, 2 xigaalkiisa u dhow mooyaane, kuwaasoo ah
hooyadiis, ama aabbihiis, ama wiilkiisa, ama gabadhiisa, ama
walaalkiis, 3 ama walaashiisa bikradda ah oo isaga u dhow,
oo aan weli nin guursan; taas wuu isu nijaasayn karaa. 4 Waa
inuusan isnijaasayn isagoo dadkiisa madax u ah, yuusan
nijaas iska dhigin. 5 Oo waa inaan ninkoodna madaxa
xiiran, oo waa inayan gadhkooda xiirin, ama ayan jidhkooda
gooyn. 6 Iyagu waa inay Ilaahooda quduus u ahaadaan, oo
ayan wax nijaas ah ka sheegin magaca Ilaahooda, waayo,
iyagu waxay bixiyaan qurbaannadii Rabbiga ee dabka lagu
sameeyo oo ah cuntada Ilaahooda, oo sidaas daraaddeed
waa inay quduus ahaadaan. 7 Waa inayan guursan naag
dhillo ah ama mid la nijaaseeyey, oo waa inayan guursan
naag la furay, waayo, wadaadku quduus buu Ilaahiis u yahay.
8 Haddaba sidaas daraaddeed waa inaad isaga quduus ka
dhigtaa, waayo, isagu wuxuu bixiyaa cuntada Ilaahaaga, oo
isagu waa inuu quduus kuu ahaadaa, waayo, anba quduus
baan ahay, anigoo ah Rabbiga quduus idinka dhiga. 9
Oo wadaad kasta haddii ay gabadhiisu isnijaasayso oo ay
dhillowdo, iyadu nijaas bay ka dhigaysaa aabbaheed, oo
waa in dab lagu gubaa. 10 Oo kii wadaadka sare walaalihiis
ka dhex ah, oo madaxiisa lagu shubay saliiddii subkidda, oo
ah kan loo daahiriyey inuu xidho dharka quduuska ah waa
inaanay timaha madaxiisu arbushnaan ama uusan dharkiisa
dildillaacin. 11 Oo weliba waa inuusan meyd gudaha ugu
gelin, oo xataa waa inuusan isu nijaasayn aabbihiis iyo
hooyadiis toona. 12 Oo waa inuusan dibadda uga bixin
meesha quduuska ah, waana inuusan nijaasayn meesha
quduuska ah ee Ilaahiisa, waayo, isaga waxaa kor saaran
taajkii saliidda subkidda ee Ilaahiisa, waayo, aniga ayaa
Rabbiga ah. 13 Oo isagu waa inuu guursadaa gabadh bikrad
ah. 14 Waa inuusan marnaba guursan carmal, ama naag la
furay, ama naag nijaasowday oo dhillo ah, laakiinse waa
inuu guursadaa gabadh bikrad ah oo dadkiisa ka dhalatay.
15 Oo waa inuusan dhashiisa ku dhex nijaasayn dadkiisa,
waayo, aniga ayaa ah Rabbiga isaga quduus ka dhiga. 16
Markaasaa Rabbigu Muuse la hadlay oo wuxuu ku yidhi, 17
Haaruun la hadal, oo waxaad ku tidhaahdaa, Tan iyo ab
ka ab ku alla kii farcankaaga ahu, isagoo iin leh, yuusan u
dhowaan inuu cuntada Ilaahiisa bixiyo. 18 Waayo, nin alla
ninkuu yahayba, kii iin lahu waa inuusan u soo dhowaan,
kaasoo ah ninkii indha la' ama curyaan ah, ama kii sankiisu
faruuran yahay, ama jidhkiisu leeyahay wax dheeraad ah, 19
ama ninkii cag jaban, ama gacan jaban, 20 ama kii tuur leh,
ama kii cilin ah, ama kii ishiisu iin leedahay, ama kii cambaar
qaba, ama kii cadho qaba, ama kii xiniinyihiisu burbureen.
21 Wadaadka Haaruun ah nin alla ninkii farcankiisa ka mid
ahu isagoo iin leh waa inuusan u soo dhowaan inuu bixiyo
qurbaannada Rabbiga oo dabka lagu sameeyo, waayo,
isagu iin buu leeyahay, oo waa inuusan u soo dhowaan inuu
cuntada Ilaahiisa bixiyo. 22 Isagu waa inuu cunaa cuntada
Ilaahiisa, tan quduuska ah iyo tan ugu wada quduusanba.
23 Laakiinse waa inuusan meesha daaha leh gelin, ama
uusan meesha allabariga u dhowaan, si uusan u nijaasayn
meelahayga quduuska ah, maxaa yeelay, isagu iin buu
leeyahay, oo aniga ayaa ah Rabbiga iyaga quduus ka dhiga.

24 Muuse sidaasuu kula hadlay Haaruun iyo wiilashiisii, iyo
dadkii reer binu Israa'iil oo dhanba.

**22** Markaasaa Rabbigu Muuse la hadlay oo wuxuu ku
yidhi, 2 La hadal Haaruun iyo wiilashiisa, oo waxaad
iyaga u sheegtaa inay iska soocaan waxyaalaha quduuska
ah oo reer binu Israa'iil, oo ay ii daahiriyaan, iyo inayan
wax nijaas ah ka sheegin magacayga quduuska ah, waayo,
aniga ayaa Rabbiga ah. 3 Oo waxaad iyaga ku tidhaahdaa,
Ku alla kii ka mid ah farcankiinna oo dhan tan iyo ab ka ab,
hadduu isagoo nijaas qaba u soo dhowaado waxyaalaha
quduuska ah oo reer binu Israa'iil ay Rabbiga u daahiriyeen,
qofkaas hortayda waa in laga gooyaa, waayo, aniga ayaa
Rabbiga ah. 4 Oo ku alla kii farcanka Haaruun ka mid
ah oo baras qaba, ama dheecaan ka daadanayaa, waa
inuusan wax ka cunin waxyaalaha quduuska ah jeeruu
daahir noqdo. Oo ku alla kii taabta wax meyd ku nijaasoobay,
ama uu taabta nin shahwaddiisu ka daadatay, 5 ama ku
alla kii taabta wax gurguurta oo uu isagu ku nijaasoobo,
amase qof isaga nijaaso qabadsiin kara, wax kastoo ay
nijaastiisu tahayba, 6 qof alla qofkii waxyaalaha caynkaas
ah taabtaa wuxuu nijaas ahaan doonaa tan iyo fiidkii, oo
waa inuusan wax ka cunin waxyaalaha quduuska ah, inuu
jidhkiisa biyo ku maydho mooyaane. 7 Oo isna markii
qorraxdu dhacdo ayuu daahir noqon doonaa, oo markaas
dabadeedna isagu wax ha ka cuno waxyaalaha quduuska
ah, maxaa yeelay, taasu waa cuntadiisii. 8 Oo isagu si
uusan ugu nijaasoobin waa inuusan innaba cunin wax
iska bakhtiyey amase dugaagu bakhtiistay, waayo, aniga
ayaa Rabbiga ah. 9 Oo sidaas daraaddeed iyagu waa inay
amarkayga xajiyaan, waaba intaasoo ay dembi u qaataan
taas aawadeed oo ay ku dhintaan haddii ay nijaaseeyaan,
waayo, aniga ayaa ah Rabbiga iyaga quduus ka dhiga. 10
Oo qof qalaadu waa inuusan waxba ka cunin waxa quduuska
ah, oo qofkii wadaadka la deggan, amase shaqaalihii la soo
kiraystay waa inuusan waxba ka cunin waxa quduuska ah.
11 Laakiinse haddii wadaad qof soo iibsado, kii uu lacagtiisa
ku soo iibsaday wax ha ka cuno, oo intii isaga gurigiisa ku
dhalatayna cuntadiisa wax ha ka cuneen. 12 Oo wadaad
gabadhiis hadday nin qalaad guursato, iyadu waa inayan
wax ka cunin qurbaanka sare loo qaado ee waxyaalaha
quduuska ah. 13 Laakiinse wadaad gabadhiis hadday carmal
tahay, ama la soo furay, oo ayan carruur lahayn, oo ay ku
soo noqoto gurigii aabbaheed, oo ay halkaas u joogto sidii
waagii ay yarayd, markaas iyadu wax ha ka cunto cuntada
aabbaheed, laakiinse qof qalaadu yuusan wax ka cunin. 14
Oo waxa quduuska ah haddii nin kama' ku cuno, intii uu
cunay oo shan meelood loo dhigay meesheed ha ku sii
daro, oo waxa quduuska ah wadaadka ha u dhiibo. 15 Oo
iyagu waa inayan nijaasayn waxyaalaha quduuska ah ee
reer binu Israa'iil oo ay Rabbiga u bixiyaan, 16 si ayan uga
dhigin inay iyagu qaataan xumaanta eedda keenta, markay
cunaan waxyaalahooda quduuska ah, waayo, aniga ayaa ah
Rabbiga iyaga quduus ka dhiga. 17 Markaasaa Rabbigu
Muuse la hadlay oo wuxuu ku yidhi, 18 Waxaad la hadashaa
Haaruun iyo wiilashiisa iyo dadka reer binu Israa'iil oo dhan,
oo waxaad ku tidhaahdaa, Ku alla kii reer binu Israa'iil ka
mid ah, ama dadka shisheeyayaasha ah ee reer binu Israa'iil
dhex deggan, markay keenaan qurbaankooda ay Rabbiga
ugu bixinayaan qurbaan la gubo aawadiis, hadduu yahay
nidarradooda midkood amase qurbaannadooda ikhtiyaarka
ah, 19 si laydiinka aqbalo aawadeed waa inaad bixisaan
neef lab oo aan iin lahayn, kaasoo ka mid ah lo'da, ama
idaha, ama orgida. 20 Laakiinse waa inaydaan bixin wax alla
wixii iin leh, waayo, waxaas laydinka aqbali maayo. 21 Oo
ku alla kii Rabbiga u bixiyo allabari qurbaanno nabaadiino
ah, si uu ku oofiyo nidar amase qurbaan ikhtiyaar ah, si
looga aqbalo aawadeed waa inuu ka bixiyaa lo'da ama
idaha neef dhan oo aan innaba iin lahayn. 22 Waa inaydaan
Rabbiga u bixin ama aydaan ka dhigin qurbaan dab lagu
sameeyo oo meesha allabariga loo saaro Rabbiga aawadiis
neef indha la', ama mid jaban, ama mid naafo ah, ama
mid qoon leh, ama mid cambaar qaba, ama mid cadho
qaba. 23 Oo dibi yar ama wan yar miduu yahayba neefkii
jidhkiisu wax dheeraad ah leeyahay ama xubnihiisa wax
ka dhiman yihiin, kaas qurbaan ikhtiyaar ah waad u bixin
kartaa, laakiinse nidar daraaddiis loo aqbali maayo. 24 Waa
inaydaan Rabbiga u bixin neef xiniinyihiisa la burburiyey,
ama la tumay, ama la jejebiyey, ama laga gooyay, oo waa
inaydaan dalkiinna sidaasoo kale ku dhex samayn. 25 Oo
kuwaas waa inaydaan ka guddoomin qof shisheeye ah
gacantiis oo aydaan ku bixin cuntada Ilaahiinna, maxaa
yeelay, iyagu wax kharriban bay leeyihiin, oo iin baa ku taal.
Sidaas daraaddeed iyaga innaba laydinka aqbali maayo. 26
Markaasaa Rabbigu Muuse la hadlay, oo wuxuu ku yidhi,
27 Markii uu dhasho dibi ama wan ama orgi intii toddoba
maalmood ah waa inuu hooyadiis ku hoos jiraa, oo maalinta
siddeedaad iyo intii ka dambaysana waa loo aqbali doonaa in
Rabbiga loogu bixiyo qurbaan dab lagu sameeyo. 28 Oo sac
iyo lax toona waa inaydaan ilmaheeda iyo iyada isku maalin
gowracin. 29 Oo markaad Rabbiga u bixinaysaan allabari
mahadnaqid ah, waa inaad kaas u bixisaan si laydiinka
aqbalo. 30 Oo isla maalintaas waa in la wada cunaa, oo waa
inaydaan waxba ka reebin tan iyo subaxda dambe, waayo,

aniga ayaa Rabbiga ah. 31 Haddaba sidaas daraaddeed
waa inaad xajisaan oo yeeshaan amarradayda, waayo,
aniga ayaa Rabbiga ah. 32 Waa inaydaan wax nijaas ah ka
sheegin magacayga quduuska ah, laakiinse quduus baan ku
dhex ahaan doonaa dadka reer binu Israa'iil, waayo, anigu
waxaan ahay Rabbiga quduus idinka dhiga, 33 oo dalkii
Masar idiinka soo bixiyey inuu Ilaah idiin ahaado aawadeed,
waayo, aniga ayaa Rabbiga ah.

**23** Markaasaa Rabbigu Muuse la hadlay oo wuxuu ku
yidhi, 2 Dadka reer binu Israa'iil la hadal oo waxaad ku
tidhaahdaa, Kuwanu waa Rabbiga iidihiisa la amray, oo aad
naadin doontaan inay ahaadaan shirar quduus ah. Xataa
kuwanu waa iidahayga la amray. 3 Lix maalmood waa in
shuqul la qabtaa, laakiinse maalinta toddobaad waa sabti
nasasho weyn leh oo ah shir quduus ah. Waa inaydaan innaba
shuqul qaban cayn kastoo uu yahayba, waayo, waa sabti ay
tahay in Rabbiga looga dhawro meel kastoo aad deggan
tihiinba. 4 Kuwanu waa Rabbiga iidihiisa la amray, oo ah
shirar quduus ah, oo ay tahay inaad naadisaan wakhtigooda
la amray. 5 Bisha kowaad, maalinteeda afar iyo tobnaad,
markay fiidkii tahay, waa Rabbiga iiddiisii Kormaridda. 6
Oo isla bishaas maalinteeda shan iyo tobnaadna waa Iidda
Kibista-aan-khamiirka-lahayn oo Rabbiga loo qabto, oo
intii toddoba maalmood ah waa inaad kibis aan khamiir
lahayn cuntaan. 7 Oo maalinta kowaad waa inaad shir
quduus ah yeelataan. Waa inaydaan innaba shuqul adag
qaban. 8 Laakiinse intii toddoba maalmood ah waa inaad
Rabbiga u bixisaan qurbaan dab lagu sameeyo, oo maalinta
toddobaad waa shir quduus ah, oo waa inaydaan innaba
shuqul adag qaban. 9 Markaasaa Rabbigu Muuse la hadlay,
oo wuxuu ku yidhi. 10 Dadka reer binu Israa'iil la hadal,
oo waxaad ku tidhaahdaa, Dalka aan idin siinaya markaad
gashaan oo aad midhaha goosataan, markaas waxaad
wadaadka u keentaan xidhmo ah beergooyska midhihiisa
ugu horreeya. 11 Oo isna xidhmada waa inuu ku ruxruxaa
Rabbiga hortiisa si laydiin aqbalo, oo maalinta sabtida ka
dambaysa wadaadku waa inuu ruxruxaa. 12 Oo maalinta
aad xidhmada ruxruxdaan, wan yar oo aan iin lahayn oo
gu jira waa inaad Rabbiga ugu bixisaan qurbaan la gubo
aawadiis. 13 Oo qurbaankiisa hadhuudhka ahuna waa inuu
ahaadaa eefaah toban meelood loo dhigay labadiis meelood
oo bur wanaagsan ah oo saliid lagu daray, kaasoo ah
qurbaan dab lagu sameeyo oo Rabbiga caraf udgoon u
ah, oo qurbaankiisa cabniinka ahuna waa inuu ahaadaa
khamri, kaasoo ah hiin afar meelood loo dhigay meesheed.
14 Oo waa inaydaan cunin kibis, ama hadhuudh duban,
ama sabuullo cusub ilaa isla maalintaas, jeeraad keentaan
qurbaankii Ilaahiinna. Kaasu weligiinba waa idiin qaynuun
tan iyo ab ka ab meel kastoo aad deggan tihiinba. 15 Oo
maalintii aad keenteen xidhmada qurbaanka la ruxruxo, oo ah
maalinta ka dambaysa sabtida, waxaad ka tirsataan toddoba
toddobaad oo kaamil ah. 16 Oo waxaad tirsataan konton
maalmood ilaa maalinta ka dambaysa sabtida toddobaad, oo
dabadeedna waxaad Rabbiga u bixisaan qurbaan hadhuudh
cusub ah. 17 Oo waa inaad rugihiinna ka keentaan laba
kibsood oo ah qurbaan la ruxruxo, oo ah eefaah toban
meelood loo dhigay labadiis meelood, oo waa inay bur
ahaadaan, oo waa in khamiir lagu dubaa oo Rabbiga loogu
keenaa qurbaan midhaha ugu horreeya. 18 Oo waxaad
kibista la keentaan toddoba wan oo yaryar oo aan iin lahayn
oo wada gu jira, iyo dibi yar, iyo laba wan oo waaweyn,
oo waa inay Rabbiga u ahaadaan qurbaan la gubo, oo
waxaad iyaga la keentaan qurbaankooda hadhuudhka ah
iyo qurbaannadooda cabniinka ahba, kuwaasoo wada ah
qurbaan dab lagu sameeyo oo Rabbiga u ah caraf udgoon.
19 Oo waa inaad bixisaan orgi qurbaan dembi ah iyo laba
wan oo yaryar oo gu jira oo ah allabari qurbaanno nabaadiino
ah. 20 Oo wadaadku waa inuu Rabbiga hortiisa qurbaan la
ruxruxo iyaga ugula ruxruxaa kibista midhaha ugu horreeya
oo raacda labada wan oo yaryar, oo iyagu quduus bay
Rabbiga u ahaan doonaan wadaadka aawadiis. 21 Oo isla
maalintaas waa inaad naadisaan inuu shir quduus ah idiin
jiri doono, oo waa inaydaan dharaartaas shuqul adag qaban,
waayo, kaasu weligiinba waa idiin qaynuun tan iyo ab ka ab
meel kastoo aad deggan tihiinba. 22 Oo markaad beeraha
dhulkiinna goosataan waa inaydaan dhammaan wada
goosan midhaha ku yaal beertiinna geesaheeda, oo weliba
waa inaydaan wada urursan xaaxaabka beergoosadkiinna;
waa inaad u daysaan miskiinka iyo shisheeyaha, waayo,
aniga ayaa ah Rabbiga Ilaahiinna ah. 23 Markaasaa Rabbigu
Muuse la hadlay oo wuxuu ku yidhi, 24 Dadka reer binu
Israa'iil la hadal, oo waxaad ku tidhaahdaa, Bisha toddobaad
maalinteeda kowaad waxay idiin ahaan doontaa nasasho
weyn oo ah buunafuufid xusuus ah, iyo shir quduus ah.
25 Oo innaba waa inaydaan shuqul adag qaban, oo waa
inaad Rabbiga u bixisaan qurbaan dab lagu sameeyo. 26
Markaasa Rabbigu Muuse la hadlay oo wuxuu ku yidhi, 27
Habase yeeshee bishan toddobaad maalinteeda tobnaad
waa maalinta kafaaraggudka. Oo waa inay idiin ahaataa shir
quduus ah, oo waa inaad nafihiinna dhibtaan; oo waa inaad
Rabbiga u bixisaan qurbaan dab lagu sameeyo. 28 Oo isla
maalintaas waa inaydaan waxba shuqul qaban cayn kasta
ha ahaadee, waayo, taasu waa maalintii kafaaraggudka

in kafaaraggud laydiinku sameeyo Rabbiga Ilaahiinna ah
hortiisa. 29 Oo qof kasta ha ahaadee kii aan maalintaas la
dhibin, dadkiisa waa in laga gooyaa. 30 Oo qof kasta ha
ahaadee kii maalintaas wax shuqul ah qabtaa cayn kastoo uu
yahayba, qofkaas ayaan ka dhex baabbi'in doonaa dadkiisa.
31 Waa inaydaan innaba shuqul qaban cayn kastoo uu
yahayba, oo kaasu weligiinba waa idiin qaynuun tan iyo ab
ka ab meel kastoo aad deggan tihiinba. 32 Oo dharaartaasu
waxay idiin ahaan doontaa sabti nasasho weyn leh, oo waa
inaad nafihiinna dhibtaan. Oo bisha maalinteeda sagaalaad
waa inaad dhawrtaan sabtidiinna tan iyo fiid ilaa ka fiid. 33
Markaasaa Rabbigu Muuse la hadlay oo wuxuu ku yidhi, 34
La hadal dadka reer binu Israa'iil, oo waxaad ku tidhaahdaa,
Bishan toddobaad maalinteeda shan iyo tobnaad waa Iiddii
Waababka oo waa in toddoba maalmood Rabbiga loo iidaa.
35 Maalinta kowaad waa inay shir quduus ah ahaataa, oo
waa inaydaan innaba shuqul adag qaban. 36 Oo intii toddoba
maalmood ah waxaad Rabbiga u bixisaan qurbaan dab
lagu sameeyo, oo maalinta siddeedaadna waa inay idiin
ahaataa shir quduus ah, oo waa inaad Rabbiga u bixisaan
qurbaan dab lagu sameeyo, oo waa inaydaan innaba shuqul
adag qaban, waayo, dharaartaasu waa shir quduus ah. 37
Kuwanu waa Rabbiga iidihiisa la amray, oo ay tahay inaad
naadisaan inay ahaadaan shirar quduus ah, oo waa inaad
Rabbiga u bixisaan qurbaan dab lagu sameeyo, kaasoo ah
qurbaan la gubo, iyo qurbaan hadhuudh ah, iyo allabari,
iyo qurbaanno cabniin ah, oo mid kastana maalintiisa ha la
bixiyo. 38 Oo kuwaasu waa ka gooni sabtiyadii Rabbiga iyo
hadiyadihiinna oo waa ka gooni nidarradiinna oo dhan, oo
waa ka gooni qurbaannadiinna ikhtiyaarka ah oo dhan ee
aad Rabbiga siisaan. 39 Habase yeeshee bisha toddobaad
maalinteeda shan iyo tobnaad, markaad midhaha dhulka
soo urursataan, waa inaad intii toddoba maalmood ah
Rabbiga iiddiisa dhawrtaan. Maalinta kowaad waa inay
ahaataa nasasho weyn, oo maalinta siddeedaadna waa inay
ahaataa nasasho weyn. 40 Oo maalinta kowaad waxaad soo
qaadataan midhaha dhirta wanaagsan, iyo laamo cawbaar
ah, iyo dhir waaweyn laamaheed, iyo safsaafka durdurka,
oo waa inaad Rabbiga Ilaahiinna ah hortiisa ku rayraysaan
intii toddoba maalmood ah. 41 Oo sannaddiiba toddoba
maalmood waa inaad Rabbiga iid u qabataan, oo kaasu waa
qaynuun weligiisba idiin jira tan iyo ab ka ab; oo iiddaas
waa inaad bisha toddobaad dhawrtaan. 42 Intii toddoba
maalmood ah waa inaad waabab ku hoyataan, oo kulli
reer binu Israa'iilka waddaniga ah oo dhammu waa inay
waabab ku hoydaan, 43 si farcankiinna dambe u ogaado
inaan reer binu Israa'iil waabab ku hoyiyey markaan iyaga
ka soo bixiyey dalkii Masar, waayo, aniga ayaa ah Rabbiga
Ilaahiinna ah. 44 Oo Muusena wuxuu reer binu Israa'iil u
sheegay iidihii Rabbiga oo la amray.

24 Markaasaa Rabbigu Muuse la hadlay oo wuxuu ku
yidhi, 2 Waxaad reer binu Israa'iil ku amartaa inay
kuu keenaan saliid saafiya oo saytuun ah oo loo tumay
laambadda, in laambad lagu shido had iyo goorba. 3
Oo daaha markhaatiga dibaddiisa oo teendhada shirka
gudaheeda ah Haaruun waa inuu Rabbiga hortiisa had iyo
goorba ku hagaajiyaa tan iyo fiidkii iyo ilaa subaxdii, oo
kaasu waa inuu ahaadaa qaynuun weligiis idiin jiri doona
tan iyo ab ka ab. 4 Oo isagu waa inuu had iyo goorba
laambadaha ku kor hagaajiyaa laambadda saafiga ah oo
Rabbiga hortiisa taal. 5 Oo waa inaad bur soo qaadataa,
oo aad ka dubtaa laba iyo toban xabbadood oo kibis ah,
oo xabbaddiiba waa inuu eefaah toban meelood loo dhigo
labadiis meelood ku jiraa. 6 Oo waa inaad laba saf u dhigtaa
oo safkiiba waxaad ka dhigtaa lix xabbadood, oo waxaad
saartaa miiska saafiga ah oo Rabbiga hortiisa yaal. 7 Oo
saf kastaba waxaad ku shubtaa foox saafi ah, si uu kibista
ugu noqdo xusuus, kaasoo ah qurbaan Rabbiga dab loogu
sameeyo. 8 Oo isagu had iyo goorba sabti kasta waa inuu
Rabbiga hortiisa ku hagaajiyaa; waayo, kaasu wuxuu reer
binu Israa'iil u yahay axdi weligiis ah. 9 Oo kibistaas waxaa
iska yeelan doona Haaruun iyo wiilashiisa, oo waa inay
meel daahir ah ku cunaan, waayo, taasu isaga waa ugu
wada quduusan tahay qurbaannada Rabbiga ee dabka lagu
sameeyo oo qaynuun weligiis ah loo amray. 10 Oo naag
reer binu Israa'iil ah wiilkeed, oo aabbihiis uu Masri ahaa
ayaa reer binu Israa'iil dhex galay, oo wiilkii naagta reer binu
Israa'iil iyo nin reer binu Israa'iil ah ayaa xerada dhexdeedii
ku diriray. 11 Markaasaa naagtii reer binu Israa'iil wiilkeedii
magicii Rabbiga caayay oo habaaray, oo isagii waxaa loo
keenay Muuse. Oo wiilkaas hooyadiis magaceedu wuxuu
ahaa Shelomiid ina Dibrii, waxayna ahayd qabiilka Daan.
12 Oo isagiina way xidheen ilaa xukunkiisu ka soo baxo
afka Rabbiga. 13 Markaasaa Rabbigu Muuse la hadlay oo
wuxuu ku yidhi, 14 Kii caytamay xerada ka soo bixi, oo
intii isaga maqashay oo dhammu gacmahooda madaxiisa
ha kor saareen, oo dabadeedna ururka oo dhammu ha
dhagxiyeen. 15 Oo waa inaad reer binu Israa'iil la hadashaa
oo waxaad ku tidhaahdaa, Ku alla kii Ilaahiisa caayaa waa
inuu dembigiisa qaadaa. 16 Kii magaca Rabbiga caaya sida
xaqiiqada ah waa in la dilaa. Ururka oo dhammu hubaal
waa inay isaga dhagxiyaan, oo hadduu shisheeye yahay iyo
hadduu waddani yahayba, markuu magaca Rabbiga caayo

waa in la dilaa. 17 Oo ku alla kii qof kale dila, sida xaqiiqada
ah waa in la dilaa. 18 Oo ku alla kii neef xoolo ah dilaana
waa inuu magaa, oo neef neef ku gudaa. 19 Oo haddii nin
deriskiisa wax yeelo, wax alla wixii uu yeelay oo kale waa
in isagana la yeelaa. 20 Jabniin jabniin ha ku mago, ilna il
ha ku mago, iligna ilig ha ku mago, oo isagu siduu qofka
wax u yeelay, saasoo kale isagana ha loo yeelo. 21 Oo kii
neef xoolo ah dilaa waa inuu isagu magaa, kii qof dilase
waa in isagana la dilaa. 22 Oo waa inaad sharci qudha u
haysataan shisheeyaha iyo waddanigaba, waayo, aniga
ayaa ah Rabbiga Ilaahiinna ah. 23 Markaasaa Muuse la
hadlay reer binu Israa'iil, oo iyana waxay xerada ka soo
bixiyeen kii caytamay, oo way dhagxiyeen. Oo reer binu
Israa'iil waxay sameeyeen sidii Rabbigu Muuse ku amray.

**25** Markaasa Rabbigu Muuse kula hadlay Buur Siinay oo
wuxuu ku yidhi, 2 Reer binu Israa'iil la hadal, oo waxaad
ku tidhaahdaa, Markaad gashaan dalka aan idin siinayo,
waa in dalku sabti Rabbiga u dhawraa. 3 Lix sannadood waa
inaad beertaada beerataa, oo lix sannadoodna waa inaad
beertaada canabka ah baarka ka jartaa, oo midhaheedana
waa inaad soo xeraysataa. 4 Laakiinse sannadda toddobaad
waa inay dhulka u ahaataa sabti nasasho weyn ah, oo taasu
waa sabti Rabbiga loo dhawro, oo waa inaadan beertaada
beeran, ama aadan beertaada canabka ah baarka ka jarin. 5
Oo sannaddaas wixii beertaada ka baxa iyagoo aan la beerin
waa inaadan guran, oo canabkaaga aan la hagaajin midhiihii
ka baxana waa inaadan urursan, waayo, sannaddaasu waa
inay dhulka u ahaataa nasasho weyn. 6 Oo dhulka sabtidiisu
cunto bay idiin ahaan doontaa. Adiga, iyo addoonkaaga,
iyo addoontaada, iyo midiidinkaaga aad kiraysatay, iyo kan
shisheeye kuu ah oo kula degganba, 7 iyo xoolahaaga,
iyo xayawaanka dalkaaga jooga oo dhan waxaa cunto u
ahaan doona midhaha dalka iska baxa oo idil. 8 Oo waa
inaad tirsataa toddoba sabtiyood oo sannado ah, taasu waxa
weeyaan toddoba meelood oo toddoba sannadood ah; oo
toddoba sabtiyood oo toddoba sannadood ah wakhtigoodu
wuxuu kuu ahaan doonaa sagaal iyo afartan sannadood. 9
Oo dabadeedna waa inaad bisha toddobaad maalinteeda
tobnaad buun dhawaajisaa, oo maalinta kafaaraggudka
waa inaad dalkiinna oo dhan buun ka dhawaajisaan. 10
Oo waa inaad sannadda kontonaad quduus ka dhigtaan,
oo dhammaan dadka dalka deggan oo dhan waxaad u
naadisaan xorriyad, oo sannaddaasu waxay idiin ahaan
doontaa wakhti yubilii ah; oo midkiin kastaa waa inuu ku
noqdaa hantidiisii, oo midkiin kastaa waa inuu ku noqdaa
qoladiisii. 11 Oo sannaddaas kontonaad wuxuu idiin ahaan
doonaa wakhti yubilii ah, oo waa inaydaan waxba beeran,
ama aydaan goosan wixii beertiinna iskood uga baxa, ama
aydaan soo urursan canabka ka baxa geedcanabka oo aan
la hagaajin. 12 Waayo, sannaddaasu waa wakhti yubilii
ah, oo waa inay idiin ahaataa mid quduus ah; oo waxaad
cuni doontaan midhaha berrinka iskood uga baxa. 13 Oo
sannaddaas yubilii ah midkiin kastaa waa inuu ku noqdaa
hantidiisii. 14 Oo haddaad deriskaaga wax ka iibisid, ama
haddaad gacanta deriskaaga wax ka iibsatid, waa inaan
midkiinna midka kale dulmin. 15 Oo sannadaha wakhtiga
yubilii ah ka dambeeya siday tiradoodu tahay waa inaad
deriskaaga wax uga iibsataa, oo isna wax ha kaaga iibiyo
siday tahay sannadaha wax la goosto. 16 Oo waa inaad
qiimaha u kordhisaa sida sannaduhu u badan yihiin, oo waa
inaad qiimaha u dhintaa sida sannaduhu u yar yihiin, waayo,
isagu wuxuu wax kaaga iibin doonaa sida ay tahay tirada
sannadaha wax la goosanayo. 17 Waa inaan midkiinna
midka kale dulmin; laakiinse waxaad ka cabsataan Ilaahiinna,
waayo, aniga ayaa ah Rabbiga Ilaahiinna ah. 18 Haddaba
sidaas daraaddeed waa inaad qaynuunnadayda yeeshaan,
oo aad xukummadaydana dhawrtaan oo yeeshaan, oo
markaasaad dalka ammaan ku degganaan doontaan. 19 Oo
dhulkuna wuxuu dhali doonaa midhihiisa, oo waxaad cuni
doontaan wax aad ka dheregtaan, oo dalkana ammaan baad
ku degganaan doontaan. 20 Oo haddaad istidhaahdaan,
Bal maxaynu sannadda toddobaad cuni doonnaa? Waayo,
waxba ma aynu beeran doonno, oo soomana urursan
doonno midhaheenna, 21 markaas anigu sannadda lixaad
ayaan barakadayda idiin amri doonaa, oo waxaa dhulka
idiinka soo bixi doona midho saddex sannadood ku filan. 22
Oo sannadda siddeedaadna wax baad beeran doontaan, oo
waxaad cuni doontaan midhihii hore, oo tan iyo ilaa aad
midhaha sannadda sagaalaad soo xeraysataan waxaad iska
cuni doontaan midhihii hore. 23 Oo dalkana waa inaydaan
hanti weligeed ah u iibin, waayo, dalka anigaa iska leh, oo
idinna waxaad tihiin shisheeyayaal iyo socoto ila jooga. 24
Oo dalka aad hantida u leedihiin oo dhan waxaad dhulka
uga oggolaataan furasho. 25 Oo haddii walaalkaa miskiin
noqdo oo uu hantidiisa qaar iibiyo, markaas xigaalkiisa ugu
dhow ha yimaado, oo ha u furto wixii walaalkiis iibiyey.
26 Oo nin hadduusan lahayn qof isaga u furta, laakiinse
uu mar dambe helo wax ku filan inuu dhulkiisii ku soo
furto, 27 markaas ha tiriyo sannadaha la iibiyey, oo waxa
dheeraadka ah ha u celiyo ninkii uu ka iibiyey; oo hantidiisii
ha ku noqdo. 28 Laakiinse hadduusan soo ceshan karin,
markaas wixii uu iibiyey waxay ku sii jiri doonaan kii ka
iibsaday gacantiisa tan iyo sannadda yubilii ah, oo sannadda
yubiliiga ah ayaa waxaasu gacantiisa ka bixi doonaan, oo

isna markaasuu hantidiisii ku noqon doonaa. 29 Oo qof
hadduu iibiyo guri lagu hoydo oo magaalo deyr leh ku yaal,
markaas intii sannad dhan ah wuu soo furan karaa gurigiisii
uu iibiyey, waayo, sannad dhan ah wuxuu xaq u leeyahay
inuu soo furto. 30 Oo haddaan la soo furan intii sannad
dhan ah, markaas gurigii magaalada deyran ku yiil waa inuu
weligii hanti u ahaadaa qofkii iibsaday, oo tan iyo ab ka ab
isagaa iska leh, oo sannadda yubilii ahna gacantiisa ka bixi
maayo. 31 Laakiinse guryaha ku dhex yaal tuulooyinka aan
lahayn deyr ku wareegsan ha lagu tiriyo beeraha duurka ku
yaal, oo iyaga waa la soo furan karaa, oo sannadda yubilii
ahna gacanta kii iibsaday way ka bixi doonaan. 32 Habase
yeeshee magaalooyinka reer Laawi saas ma aha, oo reer
Laawi mar kasta way soo furan karaan guryaha ku dhex yaal
magaalooyinka ay iyagu hantida u leeyihiin. 33 Oo mid reer
Laawi ahu hadduu soo furto, markaas gurigii la iibiyey iyo
magaaladii hantidiisa ahaydba waxay bixi doonaan wakhtiga
yubilii ah, waayo, guryaha ku dhex yaal magaalooyinka reer
Laawi waa hantidooda oo ku dhex jirta reer binu Israa'iil.
34 Laakiinse waa inaan la iibin beertii ku taal agagaarka
magaalooyinkooda, waayo, taasu waa hantidooda weligeed
ah. 35 Oo haddii walaalkaa miskiin noqdo, oo intuu ku ag
joogo masruufkiisa waayo, adigu waa inaad taageertaa, oo
isagu waa inuu kuula degganaado sidii shisheeye iyo nin
socoto ah. 36 Oo waa inaadan isaga ka qaadan korsocod
ama wax dheeraad ah toona, laakiinse Ilaahaaga ka cabso,
oo walaalkaa ha kula degganaado. 37 Oo waa inaadan
lacagtaada korsocod ku deymin, ama aadan quudkaaga u
siin si aad wax dheeraad ah kaga qaadatid. 38 Aniga ayaa
ah Rabbiga Ilaahiinna ah oo dalkii Masar idiinka soo bixiyey
inaan idin siiyo dalka Kancaan oo aan Ilaah idiin noqdo
aawadeed. 39 Oo haddii walaalkaa miskiin noqdo isagoo
kula jooga oo uu iska kaa iibiyo, waa inaadan isaga ka dhigin
inuu kuugu adeego sidii addoon oo kale, 40 laakiinse waa
inuu kuula joogaa sidii midiidin la kiraysto iyo sidii mid socoto
ah, oo waa inuu kuu adeegaa tan iyo sannadda yubilii ah,
41 oo dabadeedna ha kaa tago, isaga iyo carruurtiisaba,
oo ha ku noqdo reerkiisii iyo hantidii awowayaashiis. 42
Waayo, iyagu waa addoommadaydii aan dalkii Masar ka
soo bixiyey, oo waa inaan loo iibin sidii addoommo. 43
Waa inaadan cadaadis ugu talin, laakiinse Ilaahaaga ka
cabso. 44 Oo ragga iyo dumarka addoommada ah oo
aad lahaanaysaan waxaad ka iibsan doontaan quruumaha
hareerahiinna ku wareegsan. Iyaga waa inaad ka iibsataan
rag iyo dumar addoommo ah. 45 Oo weliba waxaad ka
iibsataan shisheeyayaasha idin dhex deggan iyo reerahooda
idinla joogaba, kuwaasoo ay dalkiinna ku dhaleen, oo waxay
ahaan doonaan hantidiin. 46 Oo iyaga waa inaad dhaxal
uga dhigtaan carruurtiinna idinka dambaysa, si ay iyana
hanti ahaan ugu haystaan; oo iyagu waa kuwa aad weligiin
addoommo ka dhiganaysaan, laakiinse walaalihiinna reer
binu Israa'iil waa inaan midkiinna midka kale cadaadis ugu
talin. 47 Oo haddii shisheeye ama socoto kula joogo uu taajir
noqdo, oo walaalkaana uu agtiisa miskiin ku noqdo oo uu
markaas iska iibiyo shisheeyaha ama socotada kula jooga
amase shisheeyaha qoladiisii, 48 markii la iibiyo dabadeed
waa la soo furan karaa. Walaalihiis mid ka mid ahu waa soo
furan karaa, 49 ama adeerkiis ama ina-adeerkiis way soo
furan karaan, amase midkii xigaal u dhow ah oo qoladiisa
ahu waa soo furan karaa, amase isaga qudhiisu hadduu
taajir noqdo waa isfuran karaa. 50 Isaga iyo kan isaga
iibsaday waa inay tiriyaan sannadihii u dhexeeyey sannaddii
uu iibsaday iyo sannadda yubilii ah, oo qiimihii iibka waa inuu
ahaadaa si waafaqsan tiradii sannadaha, oo wakhtiguu la
joogay waa inuu ahaadaa sida wakhtiga shaqaale la kiraysto.
51 Oo haddii sannado badanu ay weli dhiman yihiin, inta ay
yihiin oo kale iyaga ha uga celiyo qiimihii furashadiisa oo ha
uga bixiyo lacagtii lagu iibsaday. 52 Laakiinse haddii sannado
yaru ay ka dhiman yihiin sannadda yubilii ah, markaas waa
inuu isaga la xisaabtamo, oo inta sannadihiisu ay yihiin oo
kale waa inuu ka celiyaa qiimihii furashadiisa. 53 Oo waa
inuu isaga ula joogaa sida shaqaale la kiraysto sannad ka
sannad, oo isagu waa inuusan cadaadis hortaada ugaga
talin. 54 Oo isaga haddaan sidan lagu soo furan, markaasuu
sannadda yubilii ah bixi doonaa, isaga iyo carruurtiisaba.
55 Waayo, reer binu Israa'iil anigay addoommo ii yihiin, oo
iyagu waa addoommadaydii aan ka soo bixiyey dalkii Masar.
Aniga ayaa ah Rabbiga Ilaahiinna ah.

**26** Waa inaydaan sanamyo samaysan, ama aydaan
qotonsan ekaan la qoray amase tiir, oo waa inaydaan
dalkiinna dhagax la qoray u dhex dhigin inaad u sujuuddaan,
waayo, aniga ayaa ah Rabbiga Ilaahiinna ah. 2 Waa
inaad iidahayga dhawrtaan, oo aad meeshayda quduuska
ah maamuustaan, aniga ayaa Rabbiga ah. 3 Haddaad
qaynuunnadayda ku socotaan, oo aad amarradayda
dhawrtaan oo yeeshaan, 4 markaasaan roobkiinna idin
siinayaa xilligiisa, oo dhulkuna wuxuu dhali doonaa midhihiisa,
dhirta duurkuna midhahooday dhali doonaan. 5 Tumidda
hadhuudhkiinnu waxay gaadhi doontaa guridda canabkiinna,
guridda canabkuna waxay gaadhi doontaa ilaa wakhtiga
beeridda, oo cuntadiinna ayaad cuni doontaan ilaa aad
dheregtaan, oo dalkiinnana ammaan baad ku degganaan
doontaan. 6 Oo anigu waxaan dalka idinku siin doonaa

nabaadiino, oo idinna waad iska jiifsan doontaan, oo waxba
idinma cabsiin doonaan, oo anna dugaagga xun dalkiinna
waan ka baabbi'in doonaa, oo seefuna dalkiinna innaba
ma dhex mari doonto. 7 Oo idinku cadaawayaashiinnaad
eryan doontaan, oo iyana hortiinnay seef kaga baabbi'i
doonaan. 8 Oo shan idinka ahu boqol nin bay eryan
doonaan, oo boqol idinka ahuna toban kun oo nin bay
eryan doonaan, oo cadaawayaashiinnuna hortiinnay seef
kaga baabbi'i doonaan. 9 Oo anigu waan idiin soo jeesan
doonaa, waanan idin badin doonaa oo idin tarmin doonaa,
oo axdigaygii aan idinla dhigtayna waan sii adkayn doonaa.
10 Oo waxaad cuni doontaan midhihii hore oo aad wakhti
dheer kaydsateen, oo waxaad soo bixin doontaan midhihii
hore si aad kuwa cusub meel ugu heshaan. 11 Oo anna
taambuuggaygaan idinka dhex dhisan doonaa, oo naftayduna
idinma karhi doonto. 12 Oo dhexdiinnaan ku socon doonaa,
oo Ilaahiinnaan ahaan doonaa, oo idinkuna dadkaygaad
ahaan doontaan. 13 Anigu waxaan ahay Rabbiga Ilaahiinna
ah, oo idiinka soo bixiyey dalkii Masar si aydaan u sii ahaan
addoommadoodii. Qataarradii harqoodkiinna waan idinka
jebiyey, oo waxaan idinka dhigay inaad madaxfurnaan ku
socotaan. 14 Laakiinse haddaad i dhegaysan weydaan,
oo aydaan amarradan oo dhan wada yeelin, 15 iyo
haddaad qaynuunnadayda diiddaan, iyo haddii naftiinnu
xukummadayda karahdo, oo aad amarradayda oo dhan
wada yeeli weydaan, illowse aad igu axdi furtaan, 16
markaasaan aniguna waxyaalahan idinku samayn doonaa.
Naxdin baan idinku soo dejin doonaa, taasoo ah baabbi'id iyo
qandho indhaha idinka ridda oo naftana idinka dullaysa, oo
abuurkiinnana waxtarla'aan baad u beeran doontaan, waayo,
waxaa iska cuni doona cadaawayaashiinna. 17 Oo anna gees
baan idinka noqon doonaa, oo cadaawayaashiinna hortooda
baa laydinku layn doonaa, oo waxaa idiin talin doona kuwo
idin neceb, waadna iska carari doontaan iyadoo aan ninna
idin eryanayn. 18 Oo weliba haddaydnan waxyaalahaas
daraaddood ii dhegaysan, haddana toddoba jeer oo kale
ayaan dembiyadiinna aawadood idiin edbin doonaa. 19
Waanan jebin doonaa kibirka xooggiinna, oo samadiinnana
waxaan ka dhigi doonaa sida bir oo kale, dhulkiinnana
sida naxaas oo kale. 20 Oo xooggiinnuna waxtarla'aan
buu idinkaga dhammaan doonaa, waayo, dhulkiinnu midho
ma dhali doono, oo dhirta dalka ku taalna midho kama
soo bixin doonaan. 21 Oo haddaad i sii caasisaan oo
aydaan i dhegaysan, toddoba jeer oo kale ayaan belaayo
idiinku soo dejin doonaa siday dembiyadiinnu yihiin. 22
Oo waxaan dhexdiinna ku soo dayn doonaa dugaagga
duurka, kuwaasoo carruurtiinna idinka dhifan doona, oo
xoolihiinna baabbi'in doona, oo idin kala yarayn doona,
oo jidadkiinnuna cidla bay noqon doonaan. 23 Oo weliba
waxyaalahaas daraaddood haddaad edeb ku soo yeelan
weydaan, laakiinse aad i sii caasisaan, 24 markaas aniguna
gees baan idinka ahaan doonaa oo waan idin layn doonaa,
xataa toddoba jeer ayaan dembiyadiinna aawadood idiin
layn doonaa. 25 Oo waxaan idinku soo dejin doonaa seef
idinka aargudda aanadii axdiga, oo magaalooyinkiinna
waad ku soo wada ururi doontaan, oo anna belaayo waan
idinku dhex ridi doonaa, markaasaad cadowga u gacangeli
doontaan. 26 Oo markaan usha kibistiinna jebiyo, toban
naagood ayaa kibistiinna isku foorno ku dubi doonta, oo
haddana waxay kibistiina idinku siin doonaan miisaan, oo
kolkaad cuntaanna kama dhergi doontaan. 27 Oo haddaad
waxyaalahaas oo dhan igu dhegaysan weydaan, illowse
aad i sii caasisaan, 28 markaasaan aniguna gees idinka
ahaan doonaa, waanan xanaaqi doonaa, oo dembiyadiinna
aawadoodna ayaan toddoba jeer oo kale idiin edbin doonaa.
29 Oo waxaad cuni doontaan hilibka wiilaashiinna, oo waxaad
cuni doontaan hilibka gabdhihiinna. 30 Oo anigu meelihiinna
sarsare waan dumin doonaa, oo sanamyadiinna qorraxdana
waan wada baabbi'in doonaa, oo meydadkiinnana waxaan
ku dul xoori doonaa meydka sanamyadiinna; oo naftayduna
way idin karhi doontaa. 31 Oo magaalooyinkiinna baabba'
waan ka dhigi doonaa, oo meeshiinna quduuska ahna
cidla waan ka dhigi doonaa, oo weliba carafta fooxiinna
udgoon ma aan ursan doono. 32 Oo weliba dalkana cidla
baan ka dhigi doonaa, oo cadaawayaashiinna dalka dhex
degganuna taas way la yaabi doonaan. 33 Oo waxaan
idinku kala dhex firdhin doonaa quruumaha, oo seef gal
la' waan idinla daba geli doonaa, dalkiinnuna cidla buu
noqon doonaa, oo magaalooyinkiinnuna baabba' bay noqon
doonaan. 34 Oo markaasaa dalku sabtiyadiisa ku raaxaysan
doonaa intuu cidla yahay oo idinku aad joogtaan dalka
cadaawayaashiinna oo dhan; oo wakhtigaas oo dhan
dalku wuu iska nasan doonaa, oo wuxuu ku raaxaysan
doonaa sabtiyadiisa. 35 Oo dalku intuu cidla yahay oo dhan
wuu iska nasan doonaa, nasashadaas oo ah mid uusan
sabtiyadiinna helin markaad degganaydeen. 36 Oo intii idinka
hadhana waxaan qalbigooda ku ridi doonaa fulanimo, iyagoo
dalalka cadaawayaashooda dhex jooga, oo sanqadha caleen
dabaylu kaxaynayso ayaa iyaga eryan doonta, oo waxay uga
carari doonaan sida qof seef uga cararo, oo iyadoo aan ninna
eryanayn ayay iska daadan doonaan. 37 Oo iyagoo aan ninna
eryanayn ayaa midkoodba midka kale ku turunturoon doonaa
sidii iyagoo seef ka baqanaya. Oo innaba ma aad yeelan
doontaan itaal aad cadaawayaashiinna isku hor taagtaan. 38

Waxaad ku dhex baabbi'i doontaan quruumaha, oo dalka
cadaawayaashiinnuna waa idin dhammaysan doonaa. 39
Oo intii idinka hadhana iyagoo dalka cadaawayaashiinna
jooga ayay xumaatadooda u dulloobi doonaan, oo weliba
xumaatooyinkii awowayaashoodna ayay u dulloobi doonaan.
40 Wayna qiran doonaan xumaatadoodii iyo xumaatadii
awowayaashood, iyo xadgudubkii ay igu xadgudbeen, iyo
weliba caasinimadii ay igu caasiyeen 41 oo aan aawadeed
iyaga gees uga noqday, oo aan dalkii cadaawayaashooda
u geeyey. Markaas hadday qalbigooda buuryoqabka ah
hoosaysiiyaan, oo ay aqbalaan taqsiirta xumaatadooda,
42 ayaan soo xusuusan doonaa axdigaygii aan Yacquub
la dhigtay, iyo weliba axdigaygii aan Isxaaq la dhigtay,
oo weliba waxaan kaloo soo xusuusan doonaa axdigaygii
aan Ibraahim la dhigtay, oo dalkana waan soo xusuusan
doonaa. 43 Oo iyagu dalka way ka tegi doonaan, oo wuxuu
ku raaxaysan doonaa sabtiyadiisa intuu cidla yahay oo
iyagu ay ka maqan yihiin oo dhan; oo iyaguna way aqbali
doonaan taqsiirta xumaatadooda, maxaa yeelay, way diideen
xukummadaydii, oo naftooduna qaynuunnadayday karahday.
44 Laakiinse in kastoo ay saas sameeyeen anigu intay dalka
cadaawayaashooda joogaan oo dhan iyaga diidi maayo,
karhina maayo, wada baabbi'inna maayo, oo axdigaygii
aan la dhigtay jebin maayo, waayo, aniga ayaa ah Rabbiga
Ilaahooda ah. 45 Laakiinse iyaga daraaddood ayaan u
xusuusan doonaa axdigii aan la dhigtay awowayaashood,
kuwaasoo aan, iyadoo ay quruumuhu u jeedaan, dalkii Masar
uga soo bixiyey si aan iyaga Ilaah ugu ahaado, waayo,
aniga ayaa Rabbiga ah. 46 Kuwaasu waa qaynuunnadii iyo
xukummadii iyo sharciyadii uu Rabbigu u dhexaysiiyey isaga
qudhiisa iyo reer binu Israa'iil oo uu Muuse ugu soo dejiyey
Buur Siinay.

**27** Markaasaa Rabbigu Muuse la hadlay oo wuxuu ku
yidhi, 2 Dadka reer binu Israa'iil la hadal oo waxaad
ku tidhaahdaa, Haddii nin nidar galo, qofafka waa inay
Rabbiga ugu ahaadaan sidaad ugu qiimaysa. 3 Oo inta labka
ah oo jirta labaatan sannadood iyo ilaa lixdan sannadood
qiimayntooda aad qiimayso waa inay ahaataa konton sheqel
oo lacag ah oo le'eg sheqelka meesha quduuska ah. 4 Oo
qofku hadduu dhaddig yahayna markaas qiimayntaadu ha
ahaato soddon sheqel. 5 Oo qofku hadduu shan sannadood
jiro iyo ilaa labaatan sannadood, markaas kii lab waxaad
ku qiimaysaa labaatan sheqel, oo tii dhaddigna waxaad ku
qiimaysaa toban sheqel. 6 Oo haddii qofku jiro bil iyo ilaa
shan sannadood, markaas qofkii lab waxaad ku qiimaysaa
shan sheqel oo lacag ah, tii dhaddigna waxaad ku qiimaysaa
saddex sheqel oo lacag ah. 7 Oo haddii qofku lixdan jir yahay
amase ka sii weyn yahay, hadduu lab yahay waxaad ku
qiimaysaa shan iyo toban sheqel, hadduu dhaddig yahayna
waxaad ku qiimaysaa toban sheqel. 8 Laakiinse qofku
hadduu ka miskiinsan yahay intaad ku qiimaysay, markaas
waa in la soo taagaa wadaadka hortiisa, oo wadaadku waa
inuu qiimeeyaa, oo qofkii nidarka galay intuu awoodo waa in
wadaadku ku qiimeeyaa. 9 Oo neef Rabbiga qurbaan loogu
bixiyo hadduu yahayna, wax alla wixii qofi Rabbiga saas
ugu bixiyaa quduus bay ahaan doonaan. 10 Oo isagu waa
inuusan doorin, ama waa inuusan neef fiican mid xun ku
beddelin, ama neef xun mid fiican ku beddelin, oo hadduu
neef neef kale ku beddelo, markaas neefkii hore iyo kii
lagu beddelayba waa inay quduus wada ahaadaan. 11
Oo neefku hadduu yahay neef nijaas ah oo aan Rabbiga
qurbaan loogu bixin, markaas isagu neefka ha soo taago
wadaadka hortiisa, 12 oo wadaadku ha qiimeeyo, hadduu
xun yahay iyo hadduu fiican yahayba, oo adiga wadaadka
ahu intii aad ku qiimayso waa inay ahaataa. 13 Laakiinse
isagu hadduu doonayo inuu furto, waa inuu ku sii daraa intii
aad ku qiimaysay oo shan meelood loo dhigay meesheed.
14 Oo haddii qof doonayo inuu gurigiisa quduus uga dhigo
Rabbiga, markaas wadaadku waa inuu qiimeeyaa hadduu
xun yahay iyo hadduu fiican yahayba, oo sidii wadaadku ku
qiimeeyo ha ahaato. 15 Oo kii quduus ka dhigay hadduu
doonayo inuu gurigiisii soo furto, markaas ha ku sii daro
lacagtii aad ku qiimaysay oo shan meelood loo dhigay
meesheed, markaas isagaa lahaan doona. 16 Oo haddii
nin doonayo inuu Rabbiga quduus uga dhigo qaar ka mid
ah beertuu leeyahay, markaas waxaad ku qiimaysaa inta
abuurkeedu dhan yahay; xomeer muggiis oo shaciir abuur
ah waa in lagu qiimeeyaa konton sheqel oo lacag ah. 17
Oo beertiisa hadduu quduus ka dhigo oo uu ka bilaabo
sannadda yubilii ah, markaas intaad ku qiimaysay ha ahaato.
18 Laakiinse hadduu beertiisa quduus ka dhigo sannadda
yubilii ah dabadeed, markaas wadaadku waa inuu lacagta
u xisaabaa intay yihiin sannadaha ka dhiman sannadda
yubilii ah, oo intaad ku qiimaysayna waa in wax laga sii
dhimaa. 19 Oo kii beerta quduus ka dhigay hadduu doonayo
inuu soo furto markaas waa inuu ku sii daraa lacagtii aad
ku qiimaysay oo shan meelood loo dhigay meesheed, oo
dabadeedna mar labaad buu mulkin doonaa. 20 Laakiinse
hadduusan doonayn inuu beerta soo furto, ama hadduu
beerta nin kale ka iibiyey, markaas mar dambe waa inaan
la soo furan, 21 laakiin beertu markay wareegto sannadda
yubilii ah, waxay quduus u ahaan doontaa Rabbiga sidii
beer isaga loo soocay, hantideedana waxaa yeelan doona

wadaadka. 22 Oo hadduu Rabbiga quduus uga dhigo beer uu
soo iibsaday oo aan ahayn beerta hantidiisa ah, 23 markaas
wadaadku waa inuu xisaabaa qiimihii aad ku qiimaysay tan
iyo sannadda yubilii ah, oo isla maalintaas isagu waa inuu
wixii aad beerta ku qiimaysay u bixiyaa sida wax Rabbiga
quduus u ah. 24 Oo sannadda yubilii ahna beertu waxay u
noqon doontaa kii laga soo iibsaday, kaasoo ah kii dhulka
hanti u leh. 25 Oo waxa aad wax ku qiimayso oo dhammu
waa inay waafaqsanaadaan sheqelka meesha quduuska
ah, oo sheqelku waa inuu ahaadaa labaatan geeraah. 26
Laakiinse xayawaanka curadkooda Rabbiga gooni ahaanta
loogu soocay ninna waa inuusan quduus ka dhigin, hadduu
dibi yahay iyo hadduu ido yahayba, waayo, waxaa iska leh
Rabbiga. 27 Oo hadduu yahay neef nijaas ah markaas isagu
waa inuu ku furtaa intii aad ku qiimayso, oo weliba waa inuu
ku sii daraa intaas oo shan meelood loo dhigay meesheed,
oo haddaan la soo furanna waa in lagu iibiyaa intii aad ku
qiimayso. 28 Habase yeeshee wixii gooni loo sooco, oo qof
waxyaalihiisa oo dhan Rabbiga uga sooco, hadday waxaasu
yihiin qof, ama neef, ama beerta hantidiisa ah, waa inaan
innaba la iibin ama la furan, waayo, wax kasta oo gooni loo
sooco waa wax Rabbiga ugu wada quduusan. 29 Oo qof alla
qofkii gooni loo sooco oo dadka laga sooco oo dhan waa
inaan innaba la soo furan, laakiinse hubaal waa in la dilaa.
30 Oo meeltobnaadka waxa dalka ka baxa oo dhan hadday
yihiin dhulka iniinihiisa ama hadday yihiin midhaha dhirtaba,
Rabbigaa iska leh, oo waa wax Rabbiga quduus u ah. 31
Oo haddii qof doonayo inuu wax meeltobnaadkiisii ah furto
waa inuu ku daraa waxaas oo shan meelood loo dhigay
meeshood. 32 Oo kulli meeltobnaadka lo'da ah ama kan
adhiga ah oo dhan, wax alla wixii lagu tiriyo ee hoos maro
usha adhijirka, meeltobnaadku waa inuu Rabbiga quduus u
ahaadaa. 33 Oo neefkaasu inuu xun yahay iyo inuu fiican
yahay, isagu waa inuusan kala hubsan, waana inuusan
beddelin, oo kolnaba hadduu beddelo, markaas isagii iyo kii
lagu beddelayba waa inay quduus wada ahaadaan ee aan la
soo furan. 34 Kuwanu waa amarradii Rabbigu Muuse kaga
amray Buur Siinay oo uu reer binu Israa'iil ugu soo dhiibay.

# Tirintii

1 Rabbigu wuxuu Muuse kula hadlay cidladii Siinay, isagoo
ku jira teendhadii shirka, bishii labaad maalinteedii
kowaad, oo ah sannaddii labaad oo ay dalkii Masar ka soo
bexeen dabadeed, oo wuxuu ku yidhi, 2 Shirka reer binu
Israa'iil oo dhan u soo tiriya qolo qolo iyo reer reer, sida
ay tirada magacyadoodu tahay, nin kasta madax madax
u tiriya. 3 Oo waxaad tirisaa intii labaatan sannadood jirta
iyo intii ka sii weyn. Inta reer binu Israa'iil oo dagaal u bixi
karta oo dhan adiga iyo Haaruun waa inaad koox koox u
tirisaan. 4 Oo waa inuu idinla jiraa qabiil kasta nin ka mid
ah oo reerka aabbihiis madax u ah. 5 Oo nimanka isla kiin
taagi doona magacyadooduna waa kuwan: reer Ruubeen
waxaa ka iman Eliisuur ina Shedeeyuur. 6 Reer Simecoonna
waxaa ka iman Shelumii'eel ina Suuriishadday. 7 Reer
Yahuudahna waxaa ka iman Naxshoon ina Cammiinaadaab.
8 Reer Isaakaarna waxaa ka iman Netaneel ina Suucaar.
9 Reer Sebulunna waxaa ka iman Elii'aab ina Xeelon.
10 Oo kuwa reer Yuusufna waxaa reer Efrayim ka iman
Eliishaamaac ina Cammiihuud: oo waxaa reer Manaseh ka
iman Gamalii'eel ina Fedaahsuur. 11 Oo reer Benyaamiinna
waxaa ka iman Abiidaan ina Gidconii. 12 Oo reer Daanna
waxaa ka iman Axiiceser ina Cammiishadday. 13 Oo reer
Aasheerna waxaa ka iman Fagcii'eel ina Cokraan. 14 Oo
reer Gaadna waxaa ka iman Eliyaasaaf ina Decuu'eel. 15
Oo reer Naftaalina waxaa ka iman Axiirac ina Ceynaan. 16
Kuwanu waa kuwa shirka looga yeedhay oo amiirro u ahaa
qabiilooyinka aabbayaashood, oo waxay ahaayeen madaxdii
kumanyaalka reer binu Israa'iil. 17 Markaasaa Muuse iyo
Haaruun waxay kaxaysteen nimankaas la magacaabay,
18 oo shirkii oo dhan ayay isu soo ururiyeen bishii labaad
maalinteedii kowaad, oo waxay u soo abtirsadeen qolo qolo
iyo reer reer, oo ay madax madax u tiriyeen sida tirada
magacyadoodu ay ahayd intii labaatan sannadood jirtay
iyo intii ka sii weynaydba. 19 Oo Muusena wuxuu iyagii
cidlada Siinay ugu tiriyey sidii Rabbigu ku amray. 20 Oo reer
Ruubeen oo ahaa curadkii Israa'iil farcankoodii, qolo qolo
iyo reer reer, sidii ay tirada magacyadoodu ahayd markii
madax madax loo tiriyey, nin kasta oo labaatan sannadood
jiray iyo intii ka sii weynaydba, in alla intii dagaal u bixi
kartay oo dhan, 21 intii iyaga laga tiriyey oo ahayd qabiilka
reer Ruubeen waxay ahaayeen lix iyo afartan kun iyo shan
boqol. 22 Oo reer Simecoon farcankoodii, qolo qolo iyo reer
reer, kuwii iyaga laga tiriyey sidii ay tirada magacyadoodu
ahayd markii madax madax loo tiriyey, nin kasta oo labaatan
sannadood jiray iyo intii ka sii weynaydba, in alla intii dagaal
u bixi kartay oo dhan, 23 intii iyaga laga tiriyey oo ahayd
qabiilka reer Simecoon waxay ahaayeen sagaal iyo konton
kun iyo saddex boqol. 24 Oo reer Gaadna farcankoodii,
qolo qolo iyo reer reer, sidii ay tirada magacyadoodu ahayd,
intii labaatan sannadood jirtay iyo intii ka sii weynaydba,
in alla intii dagaal u bixi kartay oo dhan, 25 intii iyaga
laga tiriyey oo ahayd qabiilka reer Gaad waxay ahaayeen
shan iyo afartan kun iyo lix boqol iyo konton. 26 Oo reer
Yahuudahna farcankoodii, qolo qolo iyo reer reer, sidii ay
tirada magacyadoodu ahayd, intii labaatan sannadood jirtay
iyo intii ka sii weynaydba, in alla intii dagaal u bixi kartay
oo dhan, 27 intii iyaga laga tiriyey oo ahayd qabiilka reer
Yahuudah waxay ahaayeen afar iyo toddobaatan kun iyo lix
boqol. 28 Oo reer Isaakaarna farcankoodii, qolo qolo iyo
reer reer, sidii ay tirada magacyadoodu ahayd, intii labaatan
sannadood jirtay iyo intii ka sii weynaydba, in alla intii dagaal
u bixi kartay oo dhan, 29 intii iyaga laga tiriyey oo ahayd
qabiilka reer Isaakaar waxay ahaayeen afar iyo konton kun
iyo afar boqol. 30 Oo reer Sebulunna farcankoodii, qolo
qolo iyo reer reer, sidii ay tirada magacyadoodu ahayd, intii
labaatan sannadood jirtay iyo intii ka sii weynaydba, in alla
intii dagaal u bixi kartay oo dhan, 31 intii iyaga laga tiriyey oo
ahayd qabiilka reer Sebulun waxay ahaayeen toddoba iyo
konton kun iyo afar boqol. 32 Oo kuwa reer Yuusuf oo ahaa
reer Efrayim farcankoodii, qolo qolo iyo reer reer, sidii ay
tirada magacyadoodu ahayd, intii labaatan sannadood jirtay
iyo intii ka sii weynaydba, in alla intii dagaal u bixi kartay
oo dhan, 33 intii iyaga laga tiriyey oo ahayd qabiilkii reer
Efrayim waxay ahaayeen afartan kun iyo shan boqol. 34 Oo
reer Manasehna farcankoodii, qolo qolo iyo reer reer, sidii ay
tirada magacyadoodu ahayd, intii labaatan sannadood jirtay
iyo intii ka sii weynaydba, in alla intii dagaal u bixi kartay
oo dhan, 35 intii iyaga laga tiriyey oo ahayd qabiilka reer
Manaseh waxay ahaayeen laba iyo soddon kun iyo laba
boqol. 36 Oo reer Benyaamiinna farcankoodii, qolo qolo iyo
reer reer, sidii ay tirada magacyadoodu ahayd, intii labaatan
sannadood jirtay iyo intii ka sii weynaydba, in alla intii dagaal
u bixi kartay oo dhan, 37 intii iyaga laga tiriyey oo ahayd
qabiilka reer Benyaamiin waxay ahaayeen shan iyo soddon
kun iyo afar boqol. 38 Oo reer Daanna farcankoodii, qolo
qolo iyo reer reer, sidii ay tirada magacyadoodu ahayd, intii
labaatan sannadood jirtay iyo intii ka sii weynaydba, in alla
intii dagaal u bixi kartay oo dhan, 39 intii iyaga laga tiriyey oo
ahayd qabiilka reer Daan waxay ahaayeen laba iyo lixdan kun
iyo toddoba boqol. 40 Oo reer Aasheerna farcankoodii, qolo
qolo iyo reer reer, sidii ay tirada magacyadoodu ahayd, intii
labaatan sannadood jirtay iyo intii ka sii weynaydba, in alla

intii dagaal u bixi kartay oo dhan, 41 intii iyaga laga tiriyey oo ahayd qabiilka reer Aasheer waxay ahaayeen kow iyo afartan kun iyo shan boqol. 42 Oo reer Naftaalina farcankoodii, qolo qolo iyo reer reer, sidii ay tirada magacyadoodu ahayd, intii labaatan sannadood jirtay iyo intii ka sii weynaydba, in alla intii dagaal u bixi kartay oo dhan, 43 intii iyaga laga tiriyey oo ahayd qabiilka reer Naftaali waxay ahaayeen saddex iyo konton kun iyo afar boqol. 44 Kuwaasu waa kuwii la tiriyey, oo ay tiriyeen Muuse iyo Haaruun iyo amiirradii reer binu Israa'iil oo laba iyo toban nin ahaa oo midkood kastaba loo soocay reerkii aabbihiis. 45 Haddaba intii reer binu Israa'iil oo dhan ee reerihii aabbayaashood laga tiriyey, intii labaatan sannadood jirtay iyo intii ka sii weynaydba, in alla intii dagaal u bixi kartay oo dhan oo reer binu Israa'iil dhex joogtay, 46 xataa intii la tiriyey oo dhammu waxay ahaayeen lix boqol iyo saddex kun, iyo shan boqol iyo konton. 47 Laakiinse qabiilkii reer Laawi reer reer looma tirin. 48 Waayo, Rabbigu waa la hadlay Muuse oo wuxuu ku yidhi, 49 Qabiilka reer Laawi oo keliya waa inaadan tirin, oo reer binu Israa'iilna waa inaadan tiradooda ku dhex darin, 50 laakiinse reer Laawi waxaad u doorataa inay u taliyaan taambuugga maragga, iyo alaabtiisa oo dhan, iyo waxa uu isagu leeyahay oo dhan. Iyagu waa inay taambuugga iyo alaabtiisa oo dhan sidaan, oo ay u adeegaan, oo ay taambuugga hareerihiisa degaan. 51 Oo markii taambuuggu hor u dhaqaaqayo reer Laawi waa inay furaan, markii taambuugga la dhisayona reer Laawi waa inay dhisaan, oo shisheeyihii u soo dhowaadana waa in la dilaa. 52 Oo reer binu Israa'iilna markay teendhooyinkooda dhistaan, nin waluba tiisa xeradiisa ha ka dhisto, oo nin waluba calankiisa ha uga ag dhisto sida ciidammadoodu yihiin. 53 Laakiinse reer Laawi waa inay teendhooyinkooda ka dhistaan taambuugga maragga hareerihiisa, si aan cadho ugu soo degin shirka reer binu Israa'iil; oo reer Laawi waa inay u taliyaan taambuugga maragga. 54 Oo reer binu Israa'iil sidaasay yeeleen; oo sidii Rabbigu Muuse ku amray oo dhan ayay wada yeeleen.

**2** Markaasaa Rabbigu la hadlay Muuse iyo Haaruun, oo wuxuu ku yidhi, 2 Reer binu Israa'iil waa in nin waluba teendhadiisa ka ag dhistaa calankiisa, iyagoo ag jooga bandiiradihii reerka aabbahood, oo waa inay teendhooyinkooda ka dhistaan meel teendhada shirka ka hor jeedda oo hareeraheeda ah. 3 Oo kuwa ka dhistaa xagga bari dhanka qorrax ka soo baxa waa inay ahaadaan kuwa calanka xerada reer Yahuudah sida ciidammadoodu yihiin, oo amiirka reer Yahuudahna waa inuu ahaadaa Naxshoon ina Cammiinaadaab. 4 Oo ciidankiisii kuwii laga tiriyey waxay ahaayeen afar iyo toddobaatan kun iyo lix boqol. 5 Oo kuwa ku xiga oo agtiisa ka dhistaana waa inay ahaadaan qabiilka reer Isaakaar, oo amiirka reer Isaakaarna waa inuu ahaadaa Netaneel ina Suucaar. 6 Oo ciidankiisii kuwii laga tiriyey waxay ahaayeen afar iyo konton kun iyo afar boqol. 7 Qabiilka reer Sebulunna, oo amiirka reer Sebulunna waa inuu ahaadaa Elii'aab ina Xeelon. 8 Oo ciidankiisii kuwii laga tiriyeyna waxay ahaayeen toddoba iyo konton kun iyo afar boqol. 9 Oo kulli intii xerada reer Yahuudah laga tiriyey oo dhammu waxay ahaayeen boqol iyo lix iyo siddeetan kun iyo afar boqol, siday ciidammadoodu yihiin, oo iyagu waa inay marka hore baxaan. 10 Oo xagga koonfureedna waa inuu ahaadaa calanka xerada reer Ruubeen, siday ciidammadoodu yihiin, oo amiirka reer Ruubeenna waa inuu ahaadaa Eliisuur ina Shedeeyuur. 11 Oo ciidankiisii kuwii laga tiriyey waxay ahaayeen lix iyo afartan kun iyo shan boqol. 12 Oo kuwa ku xigaana waa inay ahaadaan qabiilka reer Simecoon. Oo amiirka reer Simecoonna waa inuu ahaadaa Shelumii'eel ina Suuriishadday. 13 Oo ciidankiisii kuwii laga tiriyey waxay ahaayeen sagaal iyo konton kun iyo saddex boqol. 14 Qabiilka reer Gaadna, oo amiirka reer Gaadna waa inuu ahaadaa Eliyaasaaf ina Recuu'eel. 15 Oo ciidankiisii kuwii laga tiriyey waxay ahaayeen shan iyo afartan kun iyo lix boqol iyo konton. 16 Oo kulli intii xeradii reer Ruubeen laga tiriyey waxay ahaayeen boqol iyo kow iyo konton kun iyo afar boqol iyo konton, siday ciidammadoodu ahaayeen. Oo iyana waa inay marka labaad baxaan. 17 Dabadeedna teendhada shirku waa inay baxdaa, iyadoo kooxda reer Laawi ku dhex jirta kooxaha kale, oo siday u degaan waa inay u baxaan, nin kasta oo meeshiis ku jira oo calankooda ag jooga. 18 Oo dhanka galbeedna waa inuu ahaadaa calanka xerada reer Efrayim siday ciidammadoodu yihiin, oo amiirka reer Efrayimna waa inuu ahaadaa Eliishaamaac ina Cammiihuud. 19 Oo ciidankiisii kuwii laga tiriyey waxay ahaayeen afartan kun iyo shan boqol. 20 Oo qabiilka reer Manaseh waa inuu ku xigaa; oo amiirka reer Manasehna waa inuu ahaadaa Gamalii'eel ina Fedaahsuur. 21 Oo ciidankiisii kuwii laga tiriyey waxay ahaayeen laba iyo soddon kun iyo laba boqol. 22 Qabiilkii reer Benyaamiinna, oo amiirka reer Benyaamiinna waa inuu ahaadaa Abiidaan ina Gidconii. 23 Oo ciidankiisii kuwii laga tiriyey waxay ahaayeen shan iyo soddon kun iyo afar boqol. 24 Oo kulli intii xerada reer Efrayim laga tiriyey waxay ahaayeen boqol iyo siddeed kun iyo boqol, siday ciidammadoodii ahaayeen. Oo iyana waa inay marka saddexaad baxaan. 25 Oo dhanka woqooyina waa inuu ahaadaa calanka xerada reer Daan siday ciidammadoodu yihiin, oo amiirka reer Daanna waa inuu ahaadaa Axiiceser

ina Cammiishadday. 26 Oo ciidankiisii kuwii laga tiriyey
waxay ahaayeen laba iyo lixdan kun iyo toddoba boqol. 27
Oo qabiilka reer Aasheer waa inuu ku xigaa, oo amiirka reer
Aasheerna waa inuu ahaadaa Fagcii'eel ina Cokraan. 28 Oo
ciidankiisii kuwii laga tiriyey waxay ahaayeen kow iyo afartan
kun iyo shan boqol. 29 Qabiilkii reer Naftaalina, oo amiirka
reer Naftaalina waa inuu ahaadaa Axiirac ina Ceynaan. 30
Oo ciidankiisii kuwii laga tiriyey waxay ahaayeen saddex
iyo konton kun iyo afar boqol. 31 Oo kulli intii xerada
reer Daan laga tiriyey waxay ahaayeen boqol iyo toddoba
iyo konton kun iyo lix boqol. Oo iyagu waa inay baxaan
marka ugu dambaysa, iyagoo calammadooda ag jooga.
32 Kuwaasu waa intii laga tiriyey reer binu Israa'iil siday
reerahoodu ahaayeen. Kulli intii xerooyinka laga tiriyey sidii
ciidammadoodii ahaayeen waxay ahaayeen lix boqol iyo
saddex kun iyo shan boqol iyo konton. 33 Laakiinse reer
Laawi laguma tirin reer binu Israa'iil, waayo, sidaas ayaa
Rabbigu Muuse ku amray. 34 Sidaasay reer binu Israa'iil
yeeleen, oo kulli wixii Rabbigu Muuse ku amray, sidaasay
dhammaan uga ag dhisteen calammadoodii, oo sidaasay
ugu bexeen siday qoladoodii iyo reerahoodii ahaayeen.

**3** Haddaba kuwanu waxa weeye farcammadii Haaruun
iyo Muuse waagii Rabbigu Muuse kula hadlay Buur
Siinay. 2 Oo kuwanu waa wiilashii Haaruun magacyadoodii,
Naadaab oo curadkii ahaa, iyo Abiihuu, iyo Elecaasaar, iyo
Iitaamaar. 3 Kuwaasu waa wiilashii Haaruun magacyadoodii,
oo waa wadaaddadii la subkay oo uu gooni uga dhigay inay
adeegaan shuqulka wadaadnimada. 4 Naadaab iyo Abiihuu
waxay ku dhinteen Rabbiga hortiisa, markay dab qalaad
ku bixiyeen Rabbiga hortiisa iyagoo cidlada Siinay jooga,
oo iyagu carruurna ma ay lahayn. Markaasay Elecaasaar
iyo Iitaamaar shuqulkii wadaadnimada kaga adeegi jireen
aabbahood Haaruun hortiisa. 5 Kolkaasaa Rabbigu Muuse
la hadlay oo wuxuu ku yidhi, 6 Qabiilka reer Laawi soo
dhowee oo wadaadka Haaruun hortiisa keen inay isaga u
adeegaan. 7 Oo iyagu waa inay amarkiisa iyo amarka shirka
oo dhan ku yeelaan teendhada shirka horteeda si ay hawsha
taambuugga u sameeyaan. 8 Oo waa inay dhawraan alaabta
teendhada shirka oo dhan, iyo amarka reer binu Israa'iil,
si ay hawsha taambuugga u sameeyaan. 9 Oo adigu waa
inaad reer Laawi siisaa Haaruun iyo wiilashiisaba, oo iyaga
dhammaantood waa la siiyey reer binu Israa'iil aawadood.
10 Oo waa inaad Haaruun iyo wiilashiisa doorataa, oo iyagu
waa inay dhawraan wadaadnimadooda, oo shisheeyihii u
soo dhowaadana waa in la dilaa. 11 Markaasaa Rabbigu
Muuse la hadlay oo wuxuu ku yidhi, 12 Oo bal eeg, anna
waxaan reer Laawi kala dhex baxay reer binu Israa'iil
intii aan ka qaadan lahaa curadyada reer binu Israa'iil ee
maxalka furta oo dhan, oo reer Laawi waxay ahaanayaan
kuwaygii, 13 waayo, curadyada oo dhan anigaa iska leh.
Maalintii aan curadyadii Masar oo dhan wada laayay ayaan
quduus ka wada dhigtay curadyada reer binu Israa'iil, dad
iyo duunyoba, oo iyagu kuwaygay ahaanayaan, waayo,
aniga ayaa Rabbiga ah. 14 Oo haddana Rabbigu wuxuu
Muuse kula hadlay cidlada Siinay, oo wuxuu ku yidhi, 15
Reer Laawi oo dhan u soo wada tiri reer reer iyo qolo
qolo. Nin kasta oo bil jira ama ka sii weyn waa inaad
tirisaa. 16 Markaasaa Muuse iyagii u tiriyey sidii eraygii
Rabbigu ahaa oo uu isaga ugu amray. 17 Kuwanu waxay
ahaayeen wiilashii Laawi magacyadoodii: Gershoon, iyo
Qohaad, iyo Meraarii. 18 Oo kuwanuna waa magacyadii
wiilashii Gershoon siday qolooyinkoodu yihiin, Libnii iyo
Shimcii. 19 Oo wiilashii Qohaad siday qolooyinkoodu yihiin
waa Camraam, iyo Isehaar, iyo Xebroon, iyo Cusii'eel.
20 Oo wiilashii Meraariina siday qolooyinkoodu yihiin waa
Maxlii iyo Mushii, kuwanu waa qolooyinkii reer Laawi siday
reerahoodu yihiin. 21 Oo Gershoon waxaa ka soo farcamay
reer Libnii iyo reer Shimcii, kuwaasu waa qolooyinkii reer
Gershoon. 22 Oo kuwii iyaga laga tiriyey siday ahayd tiradii
kuwii lab ahaa oo dhan, intii bil jirtay ama ka sii weynayd,
kulli intoodii la tiriyey waxay ahaayeen toddoba kun iyo
shan boqol. 23 Oo reer Gershoon qolooyinkoodii waa inay
taambuugga dabadiisa xagga galbeedka teendhooyinkooda
ka dhistaan. 24 Oo amiirka reer Gershoonna waa inuu
ahaadaa Eliyaasaaf ina Laa'eel. 25 Oo reer Gershoonna
waa inay teendhada shirka ugu taliyaan taambuuga, iyo
Teendhada, iyo dedkeeda, iyo daaha iridda teendhada shirka,
26 iyo barxadda daahyadeeda, iyo daaha iridda barxadda
oo taambuugga iyo meesha allabariga ku wareegsan iyo
xadhkihii hawsha lagu qabto oo dhan. 27 Oo Qohaadna
waxaa ka soo farcamay reer Camraam, iyo reer Isehaar, iyo
reer Xebroon, iyo reer Cusii'eel; kuwaasu waa qolooyinkii
reer Qohaad. 28 Siday ahayd tiradii kuwii lab ahaa oo dhan
intii bil jirtay ama ka sii weynayd waxay ahaayeen siddeed
kun iyo lix boqol, oo waxay u taliyeen meesha quduuska
ah. 29 Oo qolooyinka reer Qohaad waa inay taambuugga
dhankiisa koonfureed teendhooyinkooda ka dhistaan. 30 Oo
amiirka reer Qohaadna waa inuu ahaadaa Eliisaafaan ina
Cusii'eel. 31 Oo iyana waxay u talin doonaan sanduuqa, iyo
miiska, iyo laambadda, iyo meelaha allabariga, iyo weelasha
meesha quduuska ah oo ay ku adeegaan, iyo daaha, iyo
hawsha oo dhan. 32 Oo Elecaasaar ina wadaadka Haaruun
waa inuu ahaadaa amiirka amiirrada reer Laawi, oo wuxuu

korka ka ilaalin doonaa kuwa u taliya meesha quduuska
ah. **33** Oo Meraariina waxaa ka soo farcamay reer Maxlii
iyo reer Mushii, kuwaasu waa qolooyinkii reer Meraarii.
**34** Oo kuwoodii loo tiriyey siday ahayd tiradii kuwii labka
ahaa oo dhan, intii bil jirtay ama ka sii weynayd, waxay
ahaayeen lix kun iyo laba boqol. **35** Oo qabiilka reer Meraarii
amiirkoodii wuxuu ahaa Surii'eel ina Abiixayil, oo iyana
waa inay taambuugga dhankiisa woqooyi teendhooyinkooda
ka dhistaan. **36** Oo reer Meraarii waxaa loo amray inay u
taliyaan taambuugga looxyadiisa, iyo ulihiisa gudban, iyo
tiirarkiisa, iyo saldhigyadiisa, iyo alaabtiisa oo dhan, iyo
hawshiisa oo dhan, **37** iyo tiirarka barxadda ku wareegsanna,
iyo saldhigyadooda, iyo musaamiirtooda iyo xadhkahooda. **38**
Oo kuwa teendhooyinkooda ka dhistaa taambuugga xaggiisa
bari iyo teendhada shirka horteeda xagga qorrax ka soo
baxa waa inay ahaadaan Muuse iyo Haaruun iyo wiilashiisa,
oo waxay reer binu Israa'iil ugu talinayaan meesha quduuska
ah; oo shisheeyaha u soo dhowaadana waa in la dilaa. **39** Oo
kulli intii reer Laawi ah ee la tiriyey, oo Muuse iyo Haaruun
ay qolo qolo ugu tiriyeen amarkii Rabbiga, kuwii lab ahaa
oo dhan oo bil jiray ama ka sii weynaa, waxay ahaayeen
laba iyo labaatan kun. **40** Markaasaa Rabbigu wuxuu Muuse
ku yidhi, Tiri curadyada labka ah oo reer binu Israa'iil oo
dhan, intii bil jirta ama ka sii weyn, oo magacyadooda ku
soo xisaab. **41** Oo waa inaad ii qaaddaa reer Laawi intii
aad ii qaadi lahayd curadyada reer binu Israa'iil oo dhan,
oo waa inaad xoolaha reer Laawina ii qaaddaa intii aad
ii qaadi lahayd curadyada xoolaha reer binu Israa'iil oo
dhan, waayo, aniga ayaa Rabbiga ah. **42** Markaasaa Muuse
curadyadii reer binu Israa'iil oo dhan u tiriyey sidii Rabbigu
ugu amray. **43** Oo curadyadii labka ahaa oo dhammu,
sidii tirada magacyadoodu ahayd, intii bil jirtay ama ka sii
weynayd, kuwii iyaga laga soo tiriyey waxay ahaayeen laba
iyo labaatan kun iyo laba boqol iyo saddex iyo toddobaatan.
**44** Markaasaa Rabbigu Muuse la hadlay, oo wuxuu ku yidhi,
**45** Reer Laawi ii qaad intii aad ii qaadi lahayd curadyada reer
binu Israa'iil oo dhan, oo xoolaha reer Laawina ii qaad intii
aad ii qaadi lahayd xoolaha reer binu Israa'iil, oo reer Laawi
kuwaygay ahaanayaan, waayo, aniga ayaa Rabbiga ah. **46**
Oo labada boqol iyo saddex iyo toddobaatanka curad oo reer
binu Israa'iil oo ka sii badan reer Laawi, **47** madaxtiriskiiba
waxaad iigu madax furataa shan sheqel oo le'eg sheqelka
meesha quduuska ah. (Sheqelku waa labaatan geeraah.) **48**
Oo tiradooda dheeraadka ah lacagta lagu madax furtay waa
inaad Haaruun iyo wiilashiisa siisaa. **49** Markaasaa Muuse
lacagtii ka qaaday kuwii ka sii badnaa kuwii lagu madax
furtay reer Laawi. **50** Oo curadyadii reer binu Israa'iil ayuu ka
qaaday lacagtii, oo ahayd kun iyo saddex boqol iyo shan iyo
lixdan sheqel oo le'eg sheqelka meesha quduuska ah. **51**
Oo Muuse lacagtii madaxfurashada ahayd wuxuu u dhiibay
Haaruun iyo wiilashiisii, siduu ahaa eraygii Rabbigu Muuse
ku amray.

**4** Markaasaa Rabbigu Muuse iyo Haaruun la hadlay oo
wuxuu ku yidhi, **2** Reer Qohaad qolo qolo iyo reer reer
uga soo tiri reer Laawi, **3** intii soddon sannadood jirta iyo intii
ka sii weyn ilaa tan iyo konton jir dhammaan intii hawsha
gasha si ay shuqulka teendhada shirka u sameeyaan. **4** Tanu
waa hawshii reer Qohaad ee ku jirtay teendhada shirka. Waa
inay waxyaalaha ugu wada quduusan ka adeegaan. **5** Markii
dadkii xeradu ay guurayaan Haaruun iyo wiilashiisu waa inay
galaan oo iyagu waa inay daaha ilxidhka ah soo dejiyaan oo
ku daboolaan sanduuqa maragga. **6** Oo markaas dushooda
waa inay ded ah harag adhidibadeed saaraan, oo ay ku kala
dul bixiyaan maro kulligeed buluug ah, oo waa inay ulaha
lagu qaado sudhaan. **7** Oo miiska kibista tusniintana waa
inay ku kala bixiyaan maro buluug ah, oo ay dusheedana
saaraan suxuunta, iyo malqacadaha, iyo maddiibadaha, iyo
koobabka wax lagaga shubo, oo kibista joogtada ahuna
waa inay saarnaataa, **8** oo markaas waa inay dushooda
maro cas ku kala bixiyaan oo ay isla taasna dedka ah
haragga adhidibadeedka ku daboolaan, oo ay markaas
ulaha lagu qaado sudhaan. **9** Oo markaas waa inay maro
buluug ah qaadaan oo ay ku daboolaan laambadda iftiinka,
iyo laambadaheeda, iyo birqaabyadeeda, iyo alaabteeda
lagu safeeyo, iyo weelasha saliidda oo dhan oo ay kaga
adeegaan. **10** Oo iyada iyo alaabteeda oo dhanba waa inay
dhex geliyaan harag adhidibadeed oo markaas waa inay
usha lagu qaado sudhaan. **11** Oo meesha allabariga oo
dahabka ahna waa inay maro buluug ah ku daboolaan, oo
ay ku dedaan ded harag adhidibadeed ah, oo markaas waa
inay ulaha lagu qaado sudhaan. **12** Oo waa inay qaadaan
alaabta lagu adeego oo dhan oo ay kaga adeegaan meesha
quduuska ah, waana inay maro buluug ah ku wada dhex
ridaan oo ay ded ah harag adhidibadeed ku dedaan, oo
ay usha lagu qaado sudhaan. **13** Oo waa inay meesha
allabariga dambaska ka daadiyaan, oo ay maro guduudan
ku kala dul bixiyaan. **14** Waana inay saaraan alaabteeda
oo dhan oo ay kaga adeegaan, kuwaas oo ah idammada,
iyo mudacyada, iyo majarafadaha, iyo maddiibadaha, iyo
weelashii meesha allabariga oo dhan, oo markaas waa inay
ku kala dul bixiyaan ded ah harag adhidibadeed, oo ay
ulaha lagu qaado sudhaan. **15** Oo Haaruun iyo wiilashiisu
markay dhammeeyaan inay dedaan meesha quduuska ah iyo

alaabta meesha quduuska ah oo dhan, oo ay dadkii xeradu
guurayaan, reer Qohaad ha yimaadeen oo ha qaadeen;
laakiinse iyagu waa inaanay taaban waxyaalaha quduuska
ah si aanay u dhiman. Waxyaalahaasu waa waxa teendhada
shirka ku jira oo ay tahay in reer Qohaad qaadaan. 16 Oo
wadaadka Haaruun ah wiilkiisa Elecaasaar ahuna waa inuu u
taliyaa saliidda laambadda, iyo fooxa udgoon, iyo qurbaanka
hadhuudhka oo joogtada ah, iyo saliidda lagu subkado, iyo
shuqulka taambuugga oo dhan, iyo waxa ku jira oo dhan,
kuwaasoo ah meesha quduuska ah iyo alaabteedaba. 17
Markaasaa Rabbigu la hadlay Muuse iyo Haaruun oo wuxuu
ku yidhi, 18 Reer Qohaad qolooyinkooda ha ka gooynina reer
Laawi dhexdooda, 19 laakiinse sidan ku sameeya si ay u
noolaadaan oo aanay u dhiman markay u soo dhowaadaan
waxyaalaha ugu wada quduusan. Haaruun iyo wiilashiisu
waa inay gudaha galaan, oo ay iyaga u amraan hawshooda
iyo waxqaadkooda, 20 laakiinse iyagu waa inaanay xataa
daqiiqad u gelin inay waxyaalaha quduuska ah arkaan,
yaanay dhimane. 21 Oo haddana Rabbigu Muusuu la hadlay
oo wuxuu ku yidhi, 22 Reer Gershoonna qolo qolo iyo reer
reer u soo tiri. 23 Intii soddon sannadood jirta iyo intii ka
sii weyn ilaa tan iyo konton jirka waa inaad soo tirisaa,
kulli inta hawsha gasha si ay shuqulka teendhada shirka u
sameeyaan. 24 Tanu waa hawshii qolooyinka reer Gershoon
oo ah adeegidda iyo waxqaadkaba. 25 Iyagu waa inay
qaadaan daahyada taambuugga, iyo teendhada shirka, iyo
dedkeeda, iyo dedka ah haragga adhidibadeedka oo kor
saaran, iyo ilxidhka iridda teendhada shirka, 26 iyo daahyada
barxadda, iyo ilxidhka iridda barxadda ku ag taal taambuugga
iyo meesha allabariga ee ku wareegsan, iyo xadhkahooda,
iyo alaabta hawshooda oo dhan, oo wax alla wixii iyaga lagu
sameeyo oo dhan, xaggooda waa inay kaga adeegaan. 27
Oo reer Gershoon waa inay amarka Haaruun iyo wiilashiisa
ku qabtaan waxa ay qaadaan iyo shuqulka ay qabtaan oo
dhan; oo idinku waa inaad ku amartaan waxay qaadayaan.
28 Oo tanuna waa qolooyinka reer Gershoon hawshooda ku
saabsan teendhada shirka; oo shuqulkooduna waa inuu ka
hooseeyaa gacanta Iitaamaar ina Haaruun ee wadaadka ah.
29 Oo reer Meraariina waa inaad qolo qolo iyo reer reer u soo
tirisaa. 30 Intii soddon sannadood jirta iyo intii ka sii weyn
ilaa tan iyo konton jirka waa inaad soo tirisaa, mid kasta oo
hawsha gala si uu shuqulka teendhada shirka u sameeyo.
31 Oo tanuna waa hawsha ay teendhada shirka ku leeyihiin
ee ah waxa loo amray inay qaadaan: looxyada taambuugga,
iyo ulihiisa gudban, iyo tiirarkiisa, iyo saldhigyadiisa, 32
iyo tiirarka barxadda ku wareegsan, iyo saldhigyadooda,
iyo musaamiirtooda, iyo xadhkahooda, iyo alaabtooda oo
dhan, iyo hawshooda oo dhan. Oo magac magac waa
inaad ugu amartaan alaabta ay qaadayaan. 33 Taasu waa
hawshii qolooyinka reer Meraarii, sida ay tahay dhammaan
hawshooda ku saabsan teendhada shirka, oo waxay ka
hoosaysaa gacantii Iitaamaar ina Haaruun ee wadaadka
ah. 34 Markaasaa Muuse iyo Haaruun iyo amiirradii shirku
waxay reer Qohaad u tiriyeen qolo qolo iyo reer reer, 35
intii soddon sannadood jirtay iyo intii ka sii weynayd, ilaa
tan iyo konton jirka, mid kasta oo hawsha geli jiray si uu
shuqulka teendhada shirka u sameeyo. 36 Oo kuwoodii qolo
qolo loo tiriyey waxay ahaayeen laba kun iyo toddoba boqol
iyo konton. 37 Kuwanu waa kuwii qolooyinkii reer Qohaad
ee la tiriyey, kulli intii ka adeegi jirtay teendhadii shirka, oo
Muuse iyo Haaruun ay ku tiriyeen amarkii Rabbiga ee uu
gacanta Muuse u dhiibay. 38 Oo kuwii reer Gershoon ee qolo
qolo iyo reer reer loo soo tiriyey, 39 intii soddon sannadood
jirtay iyo intii ka sii weynayd ilaa tan iyo konton jirka, mid
kasta oo hawsha geli jiray si uu shuqulka teendhada shirka
u sameeyo, 40 xataa kuwoodii qolo qolo iyo reer reer loo
tiriyey waxay ahaayeen laba kun iyo lix boqol iyo soddon. 41
Oo kuwanuna waa kuwii qolooyinkii reer Gershoon, ee la
tiriyey, kulli intii ka adeegi jirtay teendhadii shirka, oo Muuse
iyo Haaruun ay amarkii Rabbiga ku tiriyeen. 42 Oo kuwii
qolooyinka reer Meraarii ee qolo qolo iyo reer reer loo tiriyey,
43 intii soddon sannadood jirtay iyo intii ka sii weynayd ilaa
tan iyo konton jirka, mid kasta oo hawsha geli jiray si uu
shuqulka teendhada shirka u sameeyo, 44 xataa kuwii qolo
qolo loo tiriyey waxay ahaayeen saddex kun iyo laba boqol.
45 Kuwanu waa kuwii qolooyinka reer Meraarii oo la tiriyey,
oo Muuse iyo Haaruun ay ku tiriyeen amarkii Rabbiga ee
uu gacanta Muuse u dhiibay. 46 Oo kulli intii reer Laawi ah
oo la soo tiriyey, oo Muuse iyo Haaruun iyo amiirradii reer
binu Israa'iil ay qolo qolo iyo reer reer u soo tiriyeen, 47
intii soddon sannadood jirtay iyo intii ka sii weynayd xataa
ilaa tan iyo konton jirka, mid kasta oo u geli jiray si uu
shuqulka hawsha u sameeyo, iyo si uu alaabta teendhada
shirka u qaado, 48 xataa kuwoodii la tiriyey waxay ahaayeen
siddeed kun iyo shan boqol iyo siddeetan. 49 Oo sidii amarka
Rabbigu ahaa ayaa loogu tiriyey gacantii Muuse, mid walba
sidii hawshiisu ahayd iyo sidii waxqaadkiisu ahaa, oo isagii
sidaasuu iyagii u tiriyey sidii Rabbigu Muuse ugu amray.

**5** Markaasaa Rabbigu Muuse la hadlay oo wuxuu ku yidhi, 2
Waxaad reer binu Israa'iil amar ku tidhaahdaa, Xerada ka
saara mid kasta oo baras qaba, iyo mid kasta oo dheecaan
ka dareera, iyo mid kasta oo meyd ku nijaasoobay. 3 Oo waa
inaad rag iyo dumarba bixisaan, oo aad xerada dibaddeeda

geeysaan si aanay u nijaasayn xeradooda aan anigu dhex
deggan ahay. 4 Oo reer binu Israa'iilna sidaasay yeeleen, oo
iyagii xerada dibaddeeday geeyeen, oo sidii Rabbigu Muuse
kula hadlay ayaa reer binu Israa'iil yeeleen. 5 Oo haddana
ayaa Rabbigu Muuse la hadlay oo wuxuu ku yidhi, 6 Reer
binu Israa'iil la hadal oo waxaad ku tidhaahdaa, Haddii nin
ama naagu ay galaan dembi ay dadku galaan, oo ay Rabbiga
ku xadgudbaan, oo ay naftaasu sidaas eed ku lahaato, 7
markaas waa inay qirtaan dembigoodii ay sameeyeen. Oo
wixii uu ku xadgudbay waa inuu dhammaan u magdhabaa,
oo weliba ku sii daraa shan meelood meesheed, oo siiyaa kii
uu ku xadgudbay. 8 Laakiinse ninku hadduusan lahayn xigto
xadgudubkii mag laga siiyo, markaas magta xadgudubka
ee Rabbiga loo bixiyo waxaa lahaan doona wadaadka;
oo weliba waxaa wehliya wanka kafaaraggudka oo isaga
aawadiis loogu kafaaro gudo. 9 Oo qurbaan kasta oo sare
loo qaado oo ah waxyaalaha quduuska ah oo dhan ee
ay reer binu Israa'iil wadaadka u keenaan waa in isagu
lahaadaa. 10 Oo nin walba waxyaalihiisa quduuska ah waa in
wadaadku lahaadaa, oo wax alla wixii nin wadaadka siiyana
isagu waa inuu lahaadaa. 11 Oo haddana ayaa Rabbigu
Muuse la hadlay oo wuxuu ku yidhi, 12 Reer binu Israa'iil la
hadal oo waxaad ku tidhaahdaa, Haddii nin naagtiis isaga ka
tagto oo ay ku xadgudubto, 13 oo haddii nin kale la jiifsado
oo waxaas ninkeedii laga qariyo oo qarsoodi loo haysto, oo
ay naagtaasu sidaas ku nijaasowdo, laakiinse markhaati loo
waayo iyada, amase aan iyada lagu qaban samayntii, 14 oo
markaas haddii masayr ku soo dego ninka oo uu naagtiisa
ka masayro oo ay iyadu nijaasowday, amase haddii masayr
ku soo dego oo uu naagtiisa ka masayro oo ayan iyadu
nijaasoobin, 15 markaas ninku waa inuu naagtiisa wadaadka
u keenaa, oo iyada aawadeed qurbaan ugu keenaa eefaah
toban meelood loo qaybiyey meeshiis bur shaciir ah. Isagu
waa inuusan saliidna ku shubin amase foox saarin, waayo,
taasu waxa weeye qurbaankii masayrka, waana qurbaan
xusuuseed oo dembiga lagu soo xusuusto. 16 Markaas
wadaadku waa inuu iyada soo dhoweeyaa oo Rabbiga
hortiisa keenaa. 17 Oo markaas wadaadku waa inuu biyo
quduus ah weel dhoobo ah ku qaadaa, oo ciidda taambuugga
dhulkiisa taalna waa in wadaadku qaadaa oo biyaha ku
shubaa, 18 oo markaas waa in wadaadku naagta keenaa
Rabbiga hortiisa, oo naagta timaheeduna ha furfurnaadaan,
oo qurbaankii xusuuseedna gacmaheeda ha ku rido, kaasoo
ah qurbaankii masayrka. Wadaadkuna gacanta ha ku haysto
biyaha qadhaadhka ah oo habaarka kiciyo. 19 Oo markaas
wadaadku iyada ha dhaariyo, oo ha ku yidhaahdo naagta,
Hadduusan nin kale kula jiifsan, oo aadan nijaaso ku
leexan, adoo ninkaaga ka dambayn lahaa, ka xorow biyahan
qadhaadhka ah oo habaarka kiciyo, 20 laakiinse haddaad
gees u leexatay adigoo ninkaaga ka dambayn lahaa, oo
aad markaas nijaasowday, oo haddii nin kale kula jiifsaday
ninkaaga mooyaane, 21 markaas wadaadku waa inuu naagta
ku dhaariyaa dhaar habaar ah, oo wadaadku naagta ha ku
yidhaahdo, Markuu Rabbigu bowdadaada hilib beeliyo oo
uu calooshaada barariyo, dadkaaga dhexdiisa ha kaaga
dhigo habaar iyo dhaar, 22 oo biyahan habaarka kiciyaa
way ku geli doonaan, oo calooshaaday bararin doonaan,
bowdadaadana way hilib beelin doonaan. Oo naagtuna
waa inay tidhaahdaa, Aamiin, Aamiin. 23 Oo wadaadkiina
waa inuu habaarradaas buug ku qoraa, oo uu biyaha
qadhaadhka ah ku baabbi'iyaa. 24 Oo waa inuu naagta
cabsiiyaa biyaha qadhaadhka ah oo habaarka kiciya, oo
biyaha habaarka kiciyaa ayaa iyada geli doona oo qadhaadh
bay noqon doonaan. 25 Oo markaas wadaadku waa inuu
qurbaankii masayrka naagta gacanteeda ka qaadaa oo
Rabbiga hortiisa ku ruxruxaa, oo markaas waa inuu meesha
allabariga keenaa. 26 Oo markaas wadaadku waa inuu
qaadaa cantoobo muggeed oo qurbaanka xusuuseed ah,
oo waa inuu meesha allabariga ku dul gubaa, oo haddana
naagta biyaha cabsiiyaa. 27 Oo markuu iyada biyaha cabsiiyo
markaas hadday iyadu nijaasowday, oo ay ninkeeda ku
xadgudubtay, biyaha habaarka kiciya iyaday geli doonaan
oo qadhaadh bay noqon doonaan, oo caloosheedu way
barari doontaa oo bowdadeeduna way hilib beeli doontaa;
oo naagtu waxay dadkeeda ku dhex ahaan doontaa habaar.
28 Laakiinse naagtu haddaanay nijaasoobin illowse ay
daahir tahay, markaas iyadu xor bay ahaanaysaa, wayna
uuraysanaysaa. 29 Kanu waa sharciga ku saabsan masayrka
haddii naagu iyadoo ninkeeda ka dambayn lahayd ka leexato
oo ay nijaasowdo, 30 ama haddii masayr ku soo dego
nin, oo uu naagtiisa ka masayro, de markaas waa inuu
naagta Rabbiga hor keenaa, oo wadaadku waa inuu iyada
sharcigaas oo dhan ku oofiyaa. 31 Oo markaas ninku dembi
xor buu ka ahaanayaa, oo naagtaasuna dembigeeda way
qaadan doontaa.

6 Markaasaa Rabbigu Muuse la hadlay oo wuxuu ku yidhi,
2 Reer binu Israa'iil la hadal oo waxaad ku tidhaahdaa,
Haddii nin ama naagu galo nidar khaas ah, kaasoo ah
nidarka Nadiirka, inuu Rabbiga gooni isugu sooco, 3 waa
inuu ka fogaadaa khamri iyo wax lagu sakhraamoba. Waa
inuusan cabbin khamri khalkiis ama wax lagu sakhraamo
khalkood, oo waa inuusan cabbin dheecaanka canabka,
uusanna cunin canab cusub ama sabiib toona. 4 Maalmaha

isa-soociddiisa oo dhan waa inuusan cunin innaba wax
laga sameeyey canab tan iyo inta hoose iyo diirka sare. 5
Maalmaha uu nidarka isa-soociddiisa qabo oo dhan waa
inaan mandiil madaxiisa la marin. Ilamaa uu dhammaystiro
maalmihii uu Rabbiga goonida isugu soocay waa inuu
quduus ahaadaa oo timaha madaxiisana waa inuu daystaa.
6 Oo maalmaha uu Rabbiga gooni isugu sooco oo dhan
waa inuusan meyd u soo dhowaan. 7 Oo waa inuusan
isu nijaasayn aabbihiis ama hooyadiis ama walaalkiis ama
walaashiis markay dhintaan; waayo, waxaa isaga saaran
soociddii uu Ilaah isu soocay. 8 Oo maalmaha isa-soociddiisa
oo dhan ayuu quduus u yahay Rabbiga. 9 Oo haddii nin
agtiisa kedis ugu dhinto oo uu isagu nijaaseeyo madaxiisii
uu gooni u soocay, markaas waa inuu madaxiisa xiiraa
maalinta daahirintiisa; maalinta toddobaad waa inuu xiiraa.
10 Oo maalinta siddeedaad waa inuu laba qoolley ama laba
xamaam oo yaryar wadaadka ugu keenaa iridda teendhada
shirka. 11 Oo markaas wadaadku waa inuu mid u bixiyaa
qurbaan dembi, midka kalena qurbaan la gubo, oo waa inuu
isaga u kafaaro gudaa, waayo, wuu ku dembaabay meyd,
oo isla maalintaas waa inuu madaxiisa quduus ka dhigaa.
12 Oo waa inuu Rabbiga gooni isugu soocaa maalmaha
isa-soociddiisa oo dhan, oo waa inuu qurbaan xadgudub u
keenaa wan gu jir ah, laakiinse waa inaan maalmihii hore loo
tirin, maxaa yeelay, isa-soociddiisii way nijaasowday. 13 Oo
kanu waa sharciga Nadiirka ku saabsan; markii maalmihii
isa-soociddiisu ay dhammaystirmaan waa in isaga la keenaa
iridda teendhada shirka, 14 oo waa inuu qurbaankiisa
Rabbiga u bixiyaa. Wan yar oo gu jir ah oo aan iin lahayn
waa inuu qurbaan la gubo u bixiyaa, oo uu sabeen gu jir ah
oo aan iin lahaynna qurbaan dembi u bixiyaa, oo wan weyn
oo aan iin lahaynna qurbaanno nabaadiino u bixiyaa, 15 iyo
dambiil ah kibis aan khamiir lahayn taasoo ah moofo ah
bur saliid lagu daray iyo canjeero aan khamiir lahayn oo
saliidu marsan tahay, iyo qurbaankooda hadhuudhka ah iyo
qurbaankooda cabniinka ah. 16 Oo markaas wadaadku waa
inuu iyaga Rabbiga hortiisa keenaa, oo waa inuu bixiyaa
qurbaankiisa dembiga iyo qurbaankiisa la gubo. 17 Oo waa
inuu Rabbiga allabari ah qurbaanno nabaadiino ugu bixiyaa
wanka iyo dambiisha kibista aan khamiirka lahayn. Oo weliba
wadaadku waa inuu bixiyaa qurbaankooda hadhuudhka ah
iyo qurbaankooda cabniinka ah. 18 Oo Nadiirku waa inuu
madaxii isa-soociddiisa ku xiiraa iridda teendhada shirka
agteeda oo markaas waa inuu qaadaa timihii madaxii isa-
soociddiisa, oo waa inuu ku shubaa dabka ka hooseeya
allabariga qurbaannada nabaadiinada ah. 19 Oo markaas
wadaadku waa inuu qaadaa wanka garabkiisa karsan, oo
dambiishana ha ka soo bixiyo xabbad moofo ah oo aan
khamiir lahayn iyo xabbad canjeero ah oo aan khamiir
lahayn, oo iyaga ha saaro gacanta Nadiirka markuu madaxii
isa-soociddiisa xiiro dabadeed. 20 Oo wadaadku waa inuu
ruxruxaa iyaga inay ahaadaan qurbaan lagu ruxruxo Rabbiga
hortiisa. Intaasu waa u quduus wadaadka oo sakaarka la
ruxruxo iyo bowdada sare loo qaadona way raacaan, oo
markaas dabadeed Nadiirku khamri wuu cabbi karaa. 21
Kaasu waa sharciga Nadiirkii nidar gala, iyo qurbaankiisa
uu Rabbiga ugu bixiyo isa-soociddiisa, iyo weliba wixii uu
isagu heli karo; oo isagu siduu nidarkiisa u nidray waa inuu
u sameeyaa, sidii sharciga isa-soociddiisa. 22 Markaasaa
Rabbigu Muuse la hadlay, oo wuxuu ku yidhi, 23 Haaruun iyo
wiilashiisa la hadal, oo waxaad ku tidhaahdaa, Idinku waa
inaad sidan reer binu Israa'iil ugu ducaysaan, oo waxaad
midkood kasta ku tidhaahdaan, 24 Rabbigu ha ku barakeeyo,
oo ha ku dhawro. 25 Rabbigu wejigiisa ha kugu iftiimiyo, oo
ha kuu roonaado. 26 Rabbigu jaahiisa kor ha kuugu qaado,
oo nabadna ha ku siiyo. 27 Oo sidaas waa inay magacayga
u saaraan reer binu Israa'iil, oo anna iyaga waan barakayn
doonaa.

7 Maalintii Muuse dhammeeyey dhisiddii taambuugga, oo
uu subkay oo quduus ka dhigay isagii iyo alaabtiisii oo
dhan iyo meeshii allabariga iyo weelasheedii oo dhan, oo uu
subkay oo quduus ka dhigay iyagii, 2 ayay amiirradii reer binu
Israa'iil oo madaxda u ahaa reerahood wax bixiyeen. Kuwanu
waxay ahaayeen amiirradii qabiilooyinka, oo iyagu waa kuwii
ka sarreeyey kuwii la tiriyey. 3 Oo waxay Rabbiga hortiisa
keeneen qurbaankoodii oo ah lix gaadhi oo dedan, iyo laba
iyo toban dibi. Labadii amiirba waxay keeneen gaadhi, amiir
kastaana dibi, oo waxay geeyeen taambuugga hortiisii. 4
Markaasaa Rabbigu la hadlay Muuse oo wuxuu ku yidhi, 5
Ka qaad iyaga inay u ahaadaan wax hawsha teendhada
shirka lagu sameeyo, oo waxaad siisaa reer Laawi, nin walba
sidii hawshiisu tahay. 6 Markaasaa Muuse gaadhiyaashii iyo
dibidii qaaday oo reer Laawi siiyey. 7 Laba gaadhi iyo afar
dibi wuxuu siiyey reer Gershoon, sidii hawshoodu ahayd. 8
Oo afar gaadhi iyo siddeed dibina wuxuu siiyey reer Meraarii,
sidii hawshoodu ahayd, oo wuxuu ugu dhiibay gacantii
wadaadkii Haaruun ahaa wiilkiisii Iitaamaar. 9 Laakiinse reer
Qohaad waxba kama uu siin, maxaa yeelay, iyagaa lahaa
hawshii meesha quduuska ah, oo waxay ku qaadi jireen
garbahooda. 10 Oo maalintii meesha allabariga la subkay
ayay amiirradii bixiyeen qurbaankii daahirinta, oo waxay
qurbaankoodii ku bixiyeen meesha allabariga horteeda. 11
Markaasaa Rabbigu Muuse ku yidhi, Iyagu qurbaankooda

waa inay u bixiyaan meesha allabariga daahirinteeda, oo
amiir kastaaba maalintiisa ha bixiyo. 12 Oo kii maalintii
kowaad qurbaankiisii bixiyey wuxuu ahaa Naxshoon oo
ahaa ina Cammiinaadaab oo reer Yahuudah ah. 13 Oo
qurbaankiisuna wuxuu ahaa saxan weyn oo lacag ah oo
miisaankiisu yahay boqol iyo soddon sheqel, iyo maddiibad
lacag ah oo miisaankeedu yahay toddobaatan sheqel oo
le'eg sheqelka meesha quduuska ah, oo labadoodaba waxaa
ka buuxay bur saliid lagu daray qurbaanka hadhuudhka
aawadiis, 14 iyo malqacad dahab ah ee miisaankeedu yahay
toban sheqel, oo foox ka buuxo. 15 Oo qurbaan la gubona
wuxuu u keenay dibi yar, iyo wan weyn, iyo wan yar oo gu jir
ah, 16 oo qurbaan dembina wuxuu u keenay orgi. 17 Oo
allabarigii qurbaannadii nabaadiinadana wuxuu u keenay
laba dibi, iyo shan wan oo waaweyn, iyo shan orgi, iyo shan
wan oo yaryar oo wada gu jir ah, oo intaasu waxay ahayd
qurbaankii Naxshoon ina Cammiinaadaab. 18 Oo maalintii
labaadna waxaa bixiyey Netaneel ina Suucaar oo amiir u
ahaa reer Isaakaar. 19 Oo qurbaankiisiina wuxuu ahaa saxan
weyn oo lacag ah oo miisaankiisu yahay boqol iyo soddon
sheqel, iyo maddiibad lacag ah oo miisaankeedu yahay
toddobaatan sheqel oo le'eg sheqelka meesha quduuska
ah, oo labadoodaba waxaa ka buuxay bur saliid lagu
daray qurbaanka hadhuudhka aawadiis, 20 iyo malqacad
dahab ah ee miisaankeedu yahay toban sheqel, oo foox
ka buuxo. 21 Oo qurbaan la gubona wuxuu u keenay dibi
yar, iyo wan weyn, iyo wan yar oo gu jir ah, 22 oo qurbaan
dembina wuxuu u keenay orgi. 23 Oo allabarigii qurbaannadii
nabaadiinadana wuxuu u keenay laba dibi, iyo shan wan
oo waaweyn, iyo shan orgi, iyo shan wan oo yaryar oo
wada gu jir ah, oo intaasu waxay ahayd qurbaankii Netaneel
ina Suucaar. 24 Oo maalintii saddexaadna waxaa bixiyey
Elii'aab ina Xeelon, oo amiir u ahaa reer Sebulun. 25 Oo
qurbaankiisiina wuxuu ahaa saxan weyn oo lacag ah oo
miisaankiisu yahay boqol iyo soddon sheqel, iyo maddiibad
lacag ah oo miisaankeedu yahay toddobaatan sheqel oo
le'eg sheqelka meesha quduuska ah, oo labadoodaba waxaa
ka buuxay bur saliid lagu daray qurbaanka hadhuudhka
aawadiis, 26 iyo malqacad dahab ah ee miisaankeedu yahay
toban sheqel, oo foox ka buuxo. 27 Oo qurbaan la gubona
wuxuu u keenay dibi yar, iyo wan weyn, iyo wan yar oo gu jir
ah, 28 oo qurbaan dembina wuxuu u keenay orgi. 29 Oo
allabarigii qurbaannadii nabaadiinadana wuxuu u keenay
laba dibi, iyo shan wan oo waaweyn, iyo shan orgi, iyo shan
wan oo yaryar oo wada gu jir ah, oo intaasu waxay ahayd
qurbaankii Elii'aab ina Xeelon. 30 Oo maalintii afraadna
waxaa bixiyey Eliisuur ina Shedeeyuur oo amiir u ahaa
reer Ruubeen. 31 Oo qurbaankiisiina wuxuu ahaa saxan
weyn oo lacag ah oo miisaankiisu yahay boqol iyo soddon
sheqel, iyo maddiibad lacag ah oo miisaankeedu yahay
toddobaatan sheqel oo le'eg sheqelka meesha quduuska
ah, oo labadoodaba waxaa ka buuxay bur saliid lagu daray
qurbaanka hadhuudhka aawadiis, 32 iyo malqacad dahab ah
ee miisaankeedu yahay toban sheqel oo foox ka buuxo. 33
Oo qurbaan la gubona wuxuu u keenay dibi yar, iyo wan
weyn, iyo wan yar oo gu jir ah, 34 oo qurbaan dembina wuxuu
u keenay orgi. 35 Oo allabarigii qurbaannadii nabaadiinadana
wuxuu u keenay laba dibi, iyo shan wan oo waaweyn, iyo
shan orgi, iyo shan wan oo yaryar oo wada gu jir ah, oo
intaasu waxay ahayd qurbaankii Eliisuur ina Shedeeyuur.
36 Oo maalintii shanaad waxaa bixiyey Shelumii'eel ina
Suuriishadday, oo amiir u ahaa reer Simecoon. 37 Oo
qurbaankiisiina wuxuu ahaa saxan weyn oo lacag ah oo
miisaankiisu yahay boqol iyo soddon sheqel, iyo maddiibad
lacag ah oo miisaankeedu yahay toddobaatan sheqel oo
le'eg sheqelka meesha quduuska ah, oo labadoodaba waxaa
ka buuxay bur saliid lagu daray qurbaanka hadhuudhka
aawadiis, 38 iyo malqacad dahab ah ee miisaankeedu yahay
toban sheqel, oo foox ka buuxo. 39 Oo qurbaan la gubona
wuxuu u keenay dibi yar, iyo wan weyn, iyo wan yar oo gu jir
ah, 40 oo qurbaan dembina wuxuu u keenay orgi. 41 Oo
allabarigii qurbaannadii nabaadiinadana wuxuu u keenay
laba dibi, iyo shan wan oo waaweyn, iyo shan orgi, iyo shan
wan oo yaryar oo wada gu jir ah, oo intaasu waxay ahayd
qurbaankii Shelumii'eel ina Suuriishadday. 42 Oo maalintii
lixaadna waxaa bixiyey Eliyaasaaf ina Decuu'eel, oo amiir u
ahaa reer Gaad. 43 Oo qurbaankiisiina wuxuu ahaa saxan
weyn oo lacag ah oo miisaankiisu yahay boqol iyo soddon
sheqel, iyo maddiibad lacag ah oo miisaankeedu yahay
toddobaatan sheqel oo le'eg sheqelka meesha quduuska
ah, oo labadoodaba waxaa ka buuxay bur saliid lagu daray
qurbaankii hadhuudhka aawadiis, 44 iyo malqacad dahab ah
ee miisaankeedu yahay toban sheqel, oo foox ka buuxo. 45
Oo qurbaan la gubona wuxuu u keenay dibi yar, iyo wan
weyn, iyo wan yar oo gu jir ah, 46 oo qurbaan dembina wuxuu
u keenay orgi. 47 Oo allabarigii qurbaannadii nabaadiinadana
wuxuu u keenay laba dibi, iyo shan wan oo waaweyn, iyo
shan orgi, iyo shan wan oo yaryar oo wada gu jir ah, oo
intaasu waxay ahayd qurbaankii Eliyaasaaf ina Decuu'eel.
48 Oo maalintii toddobaadna waxaa bixiyey Eliishaamaac
ina Cammiihuud oo amiir u ahaa reer Efrayim. 49 Oo
qurbaankiisiina wuxuu ahaa saxan weyn oo lacag ah oo
miisaankiisu yahay boqol iyo soddon sheqel, iyo maddiibad
lacag ah oo miisaankeedu yahay toddobaatan sheqel oo

le'eg sheqelka meesha quduuska ah, oo labadoodaba waxaa ka buuxay bur saliid lagu daray qurbaanka hadhuudhka aawadiis, **50** iyo malqacad dahab ah ee miisaankeedu yahay toban sheqel, oo foox ka buuxo. **51** Oo qurbaan la gubona wuxuu u keenay dibi yar, iyo wan weyn, iyo wan yar oo gu jir ah, **52** oo qurbaan dembina wuxuu u keenay orgi. **53** Oo allabarigii qurbaannadii nabaadiinadana wuxuu u keenay laba dibi, iyo shan wan oo waaweyn, iyo shan orgi, iyo shan wan oo yaryar oo wada gu jir ah, oo intaasu waxay ahayd qurbaankii Eliishaamaac ina Cammiihuud. **54** Oo maalintii siddeedaadna waxaa bixiyey Gamalii'eel ina Fedaahsuur oo amiir u ahaa reer Manaseh. **55** Oo qurbaankiisiina wuxuu ahaa saxan weyn oo lacag ah oo miisaankiisu yahay boqol iyo soddon sheqel, iyo maddiibad lacag ah oo miisaankeedu yahay toddobaatan sheqel oo le'eg sheqelka meesha quduuska ah, oo labadoodaba waxaa ka buuxay bur saliid lagu daray qurbaanka hadhuudhka aawadiis, **56** iyo malqacad dahab ah ee miisaankeedu yahay toban sheqel, oo foox ka buuxo. **57** Oo qurbaan la gubona wuxuu u keenay dibi yar, iyo wan weyn, iyo wan yar oo gu jir ah, **58** oo qurbaan dembina wuxuu u keenay orgi. **59** Oo allabarigii qurbaannadii nabaadiinadana wuxuu u keenay laba dibi, iyo shan wan oo waaweyn, iyo shan orgi, iyo shan wan oo yaryar oo wada gu jir ah, oo intaasu waxay ahayd qurbaankii Gamalii'eel ina Fedaahsuur. **60** Oo maalintii sagaalaadna waxaa bixiyey Abiidaan ina Gidconii, oo amiir u ahaa reer Benyaamiin. **61** Oo qurbaankiisiina wuxuu ahaa saxan weyn oo lacag ah oo miisaankiisu yahay boqol iyo soddon sheqel, iyo maddiibad lacag ah oo miisaankeedu yahay toddobaatan sheqel oo le'eg sheqelka meesha quduuska ah, oo labadoodaba waxaa ka buuxay bur saliid lagu daray qurbaanka hadhuudhka aawadiis, **62** iyo malqacad dahab ah ee miisaankeedu yahay toban sheqel, oo foox ka buuxo. **63** Oo qurbaan la gubona wuxuu u keenay dibi yar, iyo wan weyn, iyo wan yar oo gu jir ah, **64** oo qurbaan dembina wuxuu u keenay orgi. **65** Oo allabarigii qurbaannadii nabaadiinadana wuxuu u keenay laba dibi, iyo shan wan oo waaweyn, iyo shan orgi, iyo shan wan oo yaryar oo wada gu jir ah, oo intaasu waxay ahayd qurbaankii Abiidaan ina Gidconii. **66** Oo maalintii tobnaadna waxaa bixiyey Axiiceser ina Cammiishadday oo amiir u ahaa reer Daan. **67** Oo qurbaankiisiina wuxuu ahaa saxan weyn oo lacag ah oo miisaankiisu yahay boqol iyo soddon sheqel, iyo maddiibad lacag ah oo miisaankeedu yahay toddobaatan sheqel oo le'eg sheqelka meesha quduuska ah, oo labadoodaba waxaa ka buuxay bur saliid lagu daray qurbaanka hadhuudhka aawadiis, **68** iyo malqacad dahab ah oo miisaankeedu yahay toban sheqel, oo foox ka buuxo. **69** Oo qurbaan la gubona wuxuu u keenay dibi yar, iyo wan weyn, iyo wan yar oo gu jir ah, **70** oo qurbaan dembina wuxuu u keenay orgi. **71** Oo allabarigii qurbaannadii nabaadiinadana wuxuu u keenay laba dibi, iyo shan wan oo waaweyn, iyo shan orgi, iyo shan wan oo yaryar oo wada gu jir ah, oo intaasu waxay ahayd qurbaankii Axiiceser ina Cammiishadday. **72** Oo maalintii kow iyo tobnaadna waxaa bixiyey Fagcii'eel ina Cokraan oo amiir u ahaa reer Aasheer. **73** Oo qurbaankiisiina wuxuu ahaa saxan weyn oo lacag ah oo miisaankiisu yahay boqol iyo soddon sheqel, iyo maddiibad lacag ah oo miisaankeedu yahay toddobaatan sheqel oo le'eg sheqelka meesha quduuska ah, oo labadoodaba waxaa ka buuxay bur saliid lagu daray qurbaanka hadhuudhka aawadiis, **74** iyo malqacad dahab ah oo miisaankeedu yahay toban sheqel, oo foox ka buuxo. **75** Oo qurbaan la gubona wuxuu u keenay dibi yar, iyo wan weyn, iyo wan yar oo gu jir ah, **76** oo qurbaan dembina wuxuu u keenay orgi. **77** Oo allabarigii qurbaannadii nabaadiinadana wuxuu u keenay laba dibi, iyo shan wan oo waaweyn, iyo shan orgi, iyo shan wan oo yaryar oo wada gu jir ah, oo intaasu waxay ahayd qurbaankii Fagcii'eel ina Cokraan. **78** Oo maalintii laba iyo tobnaadna waxaa bixiyey Axiirac ina Ceynaan oo amiir u ahaa reer Naftaali. **79** Oo qurbaankiisiina wuxuu ahaa saxan weyn oo lacag ah oo miisaankiisu yahay boqol iyo soddon sheqel, iyo maddiibad lacag ah oo miisaankeedu yahay toddobaatan sheqel oo le'eg sheqelka meesha quduuska ah, oo labadoodaba waxaa ka buuxay bur saliid lagu daray qurbaanka hadhuudhka aawadiis, **80** iyo malqacad dahab ah oo miisaankeedu yahay toban sheqel, oo foox ka buuxo. **81** Oo qurbaan la gubona wuxuu u keenay dibi yar, iyo wan weyn, iyo wan yar oo gu jir ah, **82** oo qurbaan dembina wuxuu u keenay orgi. **83** Oo allabarigii qurbaannadii nabaadiinadana wuxuu u keenay laba dibi, iyo shan wan oo waaweyn, iyo shan orgi, iyo shan wan oo yaryar oo wada gu jir ah, oo intaasu waxay ahayd qurbaankii Axiirac ina Ceynaan. **84** Intaasu waxay ahayd wixii amiirradii reer binu Israa'iil ay maalintii meesha allabariga la subkay daahirinteeda u bixiyeen, waxayna ahaayeen laba iyo toban saxan oo waaweyn oo lacag ah, iyo laba iyo toban maddiibadood oo lacag ah, iyo laba iyo toban malqacadood oo dahab ah. **85** Oo miisaanka saxan kastaa oo lacag ah wuxuu ahaa boqol iyo soddon sheqel, oo kan maddiibad kastaana wuxuu ahaa toddobaatan sheqel, oo weelasha oo dhan lacagtoodu waxay ahayd laba kun iyo afar boqol oo sheqel oo le'eg sheqelka meesha quduuska ah. **86** Oo laba iyo tobanka malqacadood oo dahabka ahna waxaa ka wada buuxay foox, oo mid kastaaba waxay ahayd toban sheqel oo

le'eg sheqelka meesha quduuska ah, oo malqacadaha oo
dhan dahabkoodu wuxuu ahaa boqol iyo labaatan sheqel. **87**
Oo dibidii qurbaanka la gubo loo bixiyey oo dhammu waxay
ahaayeen laba iyo toban dibi, wanankuna waxay ahaayeen
laba iyo toban wan oo waaweyn, iyo laba iyo toban wan oo
yaryar oo wada gu jir ah, waxaana la keenay qurbaankoodii
hadhuudhka ahaa. Oo qurbaankii dembigana orgidii loo
bixiyey waxay ahaayeen laba iyo toban, **88** oo allabarigii
qurbaannadii nabaadiinada dibidii loo bixiyey oo dhammu
waxay ahaayeen afar iyo labaatan, wananka waaweynuna
waxay ahaayeen lixdan, orgiduna waxay ahaayeen lixdan,
wananka yaryar oo wada gu jirka ahuna waxay ahaayeen
lixdan. Intaasu waa wixii daahirinta meesha allabariga loo
bixiyey markii la subkay dabadeed. **89** Oo markii Muuse
u galay teendhadii shirka inuu Rabbiga la hadlo, wuxuu
maqlay Codka isaga la hadlaya oo ka yeedhaya daboolkii
saarnaa sanduuqii maragga iyo labadii keruub dhexdooda,
oo isaguna wuu la hadlay isagii.

**8** Markaasaa Rabbigu Muuse la hadlay oo ku yidhi, **2**
Haaruun la hadal, oo waxaad ku tidhaahdaa, Markaad
laambadaha shiddid, toddobada laambadood oo yaryar waa
inay ka iftiimaan laambadda horteeda. **3** Oo Haaruunna
sidaasuu yeelay, oo wuxuu wada shiday laambadaheedii si
ay uga iftiimaan laambadda horteeda, sidii Rabbigu Muuse
ku amray. **4** Oo shuqulkii laambaddu wuxuu ahaa dahab
la tumay. Tan iyo salkeeda ilaa ubaxeeda waxay wada
ahayd dahab la tumay. Sidii Rabbigu Muuse u tusay ayuu
laambaddii u sameeyey. **5** Markaasaa Rabbigu Muuse la
hadlay oo wuxuu ku yidhi, **6** Reer Laawi ka dhex sooc reer
binu Israa'iil oo iyaga daahiri. **7** Oo markaad daahirinaysid
sidan iyaga ku samee: dushooda waxaad ku rushaysaa
biyaha daahirinta, oo iyaguna timaha ha ka xiireen jidhkooda
oo dhan, oo dharkoodana ha maydheen, hana isdaahiriyeen.
**8** Oo markaas iyagu ha kaxaysteen dibi yar iyo qurbaankiisii
hadhuudhka oo ah bur saliid lagu daray, oo dibi kale oo
yarna waxaad u kaxaysaa qurbaan dembi. **9** Oo reer Laawi
waa inaad hor taagtaa teendhada shirka, oo waa inaad soo
shirisaa dadka reer binu Israa'iil oo dhan. **10** Oo reer Laawi
waa inaad keentaa Rabbiga hortiisa, oo reer binu Israa'iilna
waa inay gacmaha saaraan reer Laawi. **11** Haaruunna
waa inuu reer Laawi Rabbiga hortiisa ugu bixiyaa qurbaan
la ruxruxo ahaan reer binu Israa'iil daraaddood, si ay u
sameeyaan Rabbiga hawshiisa. **12** Oo reer Laawina waa
inay gacmaha saaraan madaxa dibida, oo mid waxaad u
bixisaa qurbaan dembi, kan kalena waxaad Rabbiga ugu
bixisaa qurbaan la gubo, si aad reer Laawi ugu kafaaro
guddid. **13** Oo reer Laawi waa inaad Haaruun iyo wiilashiisa
soo hor taagtaa, oo aad Rabbiga ugu bixisaa qurbaan la
ruxruxo ahaan. **14** Oo waa inaad reer Laawi sidaas uga
soocdaa reer binu Israa'iil, oo reer Laawina kuwaygay ahaan
doonaan. **15** Oo markaas dabadeedna reer Laawi ha u
galeen inay ka adeegaan teendhada shirka, oo waa inaad
iyaga daahirisaa oo qurbaan la ruxruxo ahaan u bixisaa.
**16** Waayo, iyaga dhammaantood ayaa la iiga soocay reer
binu Israa'iil. Intii lay siin lahaa intii maxal furta oo dhan,
kuwaasoo ah curadyada reer binu Israa'iil oo dhan, ayaan
iyaga qaatay. **17** Waayo, dad iyo duunyaba curadyada
reer binu Israa'iil oo dhan anigaa iska leh. Waxaan iyaga
quduus ka dhigtay maalintii aan wada laayay curadyadii
dalka Masar oo dhan. **18** Oo waxaan qaatay reer Laawi intii
aan qaadan lahaa curadyada reer binu Israa'iil oo dhan.
**19** Oo reer Laawi ayaan reer binu Israa'iil ka soocay oo
hadiyad ahaan u siiyey Haaruun iyo wiilashiisa inay reer binu
Israa'iil uga adeegaan teendhada shirka iyo inay reer binu
Israa'iil u kafaaro gudaan, si aan belaayo ugu dhicin reer
binu Israa'iil markii reer binu Israa'iil ay u soo dhowaadaan
meesha quduuska ah. **20** Oo Muuse iyo Haaruun iyo shirkii
reer binu Israa'iil oo dhammu sidaasay ku sameeyeen
reer Laawi. Wixii reer Laawi ku saabsanaa ee uu Rabbigu
Muuse ku amray oo dhan ayay reer binu Israa'iil wada
yeeleen. **21** Oo reer Laawina dembi way iska daahiriyeen, oo
dharkoodiina way maydheen, markaasaa Haaruun qurbaan
la ruxruxo ahaan Rabbiga hortiisa iyaga ugu bixiyey, oo
inuu iyaga daahiriyo aawadeed ayaa Haaruun u kafaaro
guday. **22** Oo markaas dabadeed ayaa reer Laawi gudaha
u galeen inay teendhada shirka kaga adeegaan Haaruun
iyo wiilashiisa hortooda, oo wixii reer Laawi ku saabsanaa
ee uu Rabbigu Muuse ku amray ayay ku sameeyeen. **23**
Markaasaa Rabbigu Muuse la hadlay oo wuxuu ku yidhi, **24**
Tanu waa waxa reer Laawi intii shan iyo labaatan sannadood
jirta ama ka sii weyn ay leeyihiin inay sameeyaan. Iyagu ha
galeen oo ha ka adeegeen hawsha teendhada shirka. **25**
Oo markii ay konton jir gaadhaan waa inay ka joogsadaan
hawsha ka-adeegiddeeda oo aanay mar dambe adeegin, **26**
laakiinse walaalahood teendhada shirka ha kala adeegeen
si ay amarka u hayaan laakiinse yaanay hawl dambe qaban.
Sidaas waa inaad ka yeeshaa amarrada ku saabsan reer
Laawi hawshooda.

**9** Markaasaa Rabbigu Muuse kula hadlay cidladii Siinay,
bishii kowaad ee sannaddii labaad oo ka dambaysay
wakhtigii ay dalkii Masar ka soo bexeen, oo wuxuu ku yidhi,
**2** Weliba reer binu Israa'iil ha dhawreen Iidda Kormaridda
xilligeedii la amray. **3** Bishan maalinteeda afar iyo tobnaad

markay fiidkii tahay waa inaad dhawrtaan xilligeedii la amray.
Waxaad u dhawrtaan sida qaynuunnadeedii iyo amarradeedii
oo dhammu ay yihiin. 4 Markaasaa Muuse la hadlay reer
binu Israa'iil oo wuxuu u sheegay inay Iidda Kormaridda
dhawraan. 5 Oo bishii kowaad maalinteedii afar iyo tobnaad
markay fiidkii ahayd ayay Iiddii Kormaridda ku dhawreen
cidladii Siinay; oo sidii Rabbigu Muuse ku amray oo dhan
ayay reer binu Israa'iil wada yeeleen. 6 Oo waxaa jiray
niman ku nijaasoobay nin dhintay meydkiis oo aanay sidaas
aawadeed karin inay maalintaas Iiddii Kormaridda dhawraan,
oo maalintaasay yimaadeen Muuse iyo Haaruun hortooda.
7 Oo nimankaasu waxay isagii ku yidhaahdeen, Annagu
waxaannu ku nijaasownay nin dhintay meydkiis. Haddaba
maxaa nalooga celiyey inaannu reer binu Israa'iil la bixinno
qurbaankii Rabbiga xilligii la amray? 8 Markaasaa Muuse ku
yidhi, I suga intaan soo maqlayo waxa Rabbigu amri doono
oo idinku saabsan. 9 Markaasaa Rabbigu Muuse la hadlay
oo wuxuu ku yidhi, 10 Reer binu Israa'iil la hadal oo waxaad
ku tidhaahdaa, Haddii nin idinka mid ah amase farcankiinna
ka mid ahu uu ku nijaasoobo sabab meyd ka timid, amase
hadduu sodcaal dheer ku jiro, weli waa inuu Rabbiga u
dhawraa Iidda Kormaridda. 11 Bishii labaad maalinteeda afar
iyo tobnaad markay fiidka tahay waa inay dhawraan oo ay
kibis aan khamiir lahayn iyo caleemo qadhaadh cunaan. 12
Waa inayan waxba ka reebin ilaa subaxda, oo ayan lafahana
mid ka jebin. Waa inay u dhawraan sida qaynuunka Iidda
Kormaridda yahay oo dhan. 13 Laakiinse ninkii daahir ah
oo aan sodcaal ku jirin oo ka hadha inuu dhawro Iidda
Kormaridda, qofkaasu waa ka go'i doonaa dadkiisa, maxaa
yeelay, wuxuusan bixin qurbaankii Rabbiga xilligiisii la amray,
oo ninkaasu dembigiisuu qaadan doonaa. 14 Oo haddii
nin qalaad dhexdiinna deggan yahay, oo uu doonayo inuu
Rabbiga u dhawro Iidda Kormaridda, waa inuu u sameeyaa
sida ay Iidda Kormaridda qaynuunkeeda iyo amarkeedu
yihiin, oo kii qalaad iyo kii dalka ku dhashayba waa inaad
isku qaynuun u lahaataan. 15 Oo maalintii taambuugga
la dhisay ayaa daruurtu qarisay taambuuggii, kaasoo ah
teendhadii maragga, oo fiidkii waxay taambuuggii korkiisa
uga muuqatay sida wax dab u eg ilaa subaxdii. 16 Oo
sidaasay mar kasta ahayd. Maalintii daruurtii baa qarisay,
habeenkiina wax dab u eg. 17 Oo mar alla markii daruurta
Teendhada korkeeda laga qaado, dabadeed ayaa reer binu
Israa'iil guuri jireen, oo meeshii daruurtu degto ayay reer
binu Israa'iil degi jireen. 18 Oo reer binu Israa'iil waxay ku
guuri jireen amarka Rabbiga, waxayna ku degi jireen amarka
Rabbiga; oo in alla inta daruurtu taambuugga kor joogto
halkaasay iska sii degganaan jireen. 19 Oo haddii daruurtu
taambuugga kor joogto maalmo badan, markaas reer binu
Israa'iil way xajin jireen amarka Rabbiga oo mana ay guuri
jirin. 20 Oo marmarna daruurtu taambuugga waxay kor joogi
jirtay dhawr maalmood, oo markaas sidii amarka Rabbigu
ahaa way iska sii degganaan jireen, oo waxay ku guuri jireen
sidii amarka Rabbigu ahaa. 21 Oo marmarna daruurtu waxay
joogtay fiidkii ilamaa subaxdii; oo markii daruurta subaxdii
la qaado ayay guuri jireen; oo hadday habeen iyo maalin
sii joogtana, markii daruurta la qaado ayay guuri jireen. 22
Oo hadday tahay laba maalmood ama bil ama sannad, in
alla intii daruurtu taambuugga dul joogto, oo ay kor deggan
tahay, reer binu Israa'iil way iska sii degganaan jireen, oo
mana ay guuri jirin; laakiinse markii daruurta kor loo qaado
way guuri jireen. 23 Waxay ku degi jireen amarka Rabbiga,
oo waxay ku guuri jireen amarka Rabbiga. Iyagu xukunkii
Rabbiga ayay ku dhawri jireen amarkii Rabbigu ugu soo
dhiibay Muuse.

**10** Markaasaa Rabbigu Muuse la hadlay oo wuxuu ku yidhi,
2 Laba turumbo oo lacag ah samayso, oo waxaad iyaga
ka samaysaa lacag la tumay, oo waa inaad u isticmaashaa
ururka markaad isugu yeedhayso iyo markay xerooyinkii
guurayaan. 3 Oo markii iyaga laga dhawaajiyo, ururka oo
dhammu waa inay kuugu soo shiraan iridda teendhada
shirka. 4 Oo haddii mid keliya la afuufo markaas waxaa
kuu soo shiraya amiirrada ah utaliyayaasha kumanyaalka
reer binu Israa'iil. 5 Oo markaad turumbada digtoonaanta
afuuftaan, xerooyinka xagga bari degganu waa inay guuraan.
6 Oo haddana markaad turumbada digtoonaanta afuuftaan
mar labaad, xerooyinka xagga koonfureed degganu ha
guureen; oo waa inay afuufaan turumbo digtoonaaneed
guuriddooda aawadeed. 7 Laakiinse markii shirka laysu
soo ururinayo waa inaad turumbada afuuftaan, laakiinse
tan digtoonaanta ha ka dhawaajinina. 8 Oo wadaaddada
ah wiilasha Haaruun waa inay turumbooyinka afuufaan, oo
iyagu waa inay idiin ahaadaan qaynuun tan iyo qarniyadiinna
oo dhan. 9 Oo markaad waddankiinna dhexdiisa dagaal ugu
baxaysaan cadowgiinna idin cadaadiya waa inaad digtoonaan
kaga dhawaajisaan turumbooyinka, oo markaasuu Rabbiga
Ilaahiinna ahu idin xusuusan doonaa, oo cadaawayaashiinna
ayaa laydinka badbaadin doonaa. 10 Oo weliba maalintii aad
faraxdaan, iyo markaad iidihiinna la amray dhawrtaan, iyo
markay bilaha idiin dhashaan, waa inaad turumbooyinka ku
dul dhawaajisaan qurbaannadiinna la gubo, iyo allabaryada
qurbaannadiina nabaadiinada ah, oo iyana xusuus bay
idiinku noqon doonaan Ilaahiinna hortiisa, waayo, aniga ayaa
ah Rabbiga Ilaahiinna ah. 11 Sannaddii labaad, bisheedii

labaad, maalinteedii labaatanaad ayaa daruurtii laga qaaday
taambuuggii maragga korkiisa. 12 Oo markaasay reer binu
Israa'iil cidlada Siinay uga guureen sida sodcaalkoodii loo
amray, oo daruurtiina waxay degtay cidladii Faaraan. 13
Oo iyana markii hore waxay sodcaalkoodii ku bilaabeen
amarkii Rabbigu u soo dhiibay Muuse. 14 Oo horta waxaa
baxay calankii xeradii reer Yahuudah siday ciidammadoodu
ahaayeen. Oo ciidankiisana waxaa u sarreeyey Naxshoon ina
Cammiinaadaab. 15 Oo qabiilka reer Isaakaar ciidankoodana
waxaa u sarreeyey Netaneel ina Suucaar. 16 Oo qabiilka
reer Sebulun ciidankoodana waxaa u sarreeyey Elii'aab ina
Xeelon. 17 Markaasaa taambuuggii la furay oo reer Gershoon
iyo reer Meraarii oo taambuugga qaadi jiray ayaa baxay. 18
Oo haddana waxaa baxay calankii xeradii reer Ruubeen
siday ciidammadoodu ahaayeen, oo ciidankiisana waxaa
u sarreeyey Eliisuur ina Shedeeyuur. 19 Oo qabiilkii reer
Simecoon ciidankoodana waxaa u sarreeyey Shelumii'eel
ina Suuriishadday. 20 Oo qabiilkii reer Gaad ciidankoodana
waxaa u sarreeyey Eliyaasaaf ina Decuu'eel. 21 Oo
haddana waxaa baxay reer Qohaad oo teendhadii quduuska
ahayd sida, oo kuwii kalena taambuuggay dhiseen intay
iyagu soo socdeen. 22 Oo haddana waxaa baxay calankii
xeradii reer Efrayim siday ciidammadoodu ahaayeen,
oo ciidankiisana waxaa u sarreeyey Eliishaamaac ina
Cammiihuud. 23 Oo qabiilka reer Manaseh ciidankoodana
waxaa u sarreeyey Gamalii'eel ina Fedaahsuur. 24 Oo qabiilka
reer Benyaamiin ciidankoodana waxaa u sarreeyey Abiidaan
ina Gidconii. 25 Oo haddana calankii xeradii reer Daan
oo ugu wada dambeeyey xerooyinka oo dhan ayaa baxay
siday ciidammadoodu ahaayeen, oo ciidankiisana waxaa u
sarreeyey Axiiceser ina Cammiishadday. 26 Oo qabiilka reer
Aasheer ciidankoodana waxaa u sarreeyey Fagcii'eel ina
Cokraan. 27 Oo qabiilkii reer Naftaali ciidankoodana waxaa
u sarreeyey Axiirac ina Ceynaan. 28 Sidaasay reer binu
Israa'iil u sodcaaleen siday ciidammadoodu ahaayeen, oo
hore bay u bexeen. 29 Markaasaa Muuse wuxuu ku yidhi
Xoobaab ina Recuu'eel oo reer Midyaan ahaa, oo Muuse
soddog u ahaa, Annagu waxaannu u sodcaalaynaa meeshii
Rabbigu yidhi, Waan idin siinayaa. Haddaba na soo raac, oo
annana wanaag waannu kuu samaynaynaa, maxaa yeelay,
Rabbigu wanaag ayuu ugu ballanqaaday reer binu Israa'iil.
30 Oo isna wuxuu isagii ku yidhi, Anigu tegi maayo, laakiinse
waxaan u kacayaa dalkaygii iyo dadkaygii. 31 Oo isna wuxuu
ku yidhi, Waan ku baryayaaye ha naga tegin, waayo, adigu
waad garanaysaa sida roon ee aannu cidlada u degno,
oo waxaad noo ahaanaysaa indho oo kale. 32 Oo weliba
haddaad na raacdo, wax kasta oo wanaagsan oo Rabbigu
noo sameeyo annana waannu kuu samaynaynaa. 33 Oo
iyaguna buurtii Rabbiga ayay saddex maalmood socodkood
ka sii sodcaaleen, sanduuqii axdiga Rabbiguna iyaguu hor
kacay intii saddex maalmood socodkood ah, inuu iyaga u
sii doondoono meel ay ku nastaan. 34 Markay xerada ka
bexeen ayaa daruurtii Rabbigu maalinnimada oo dhan dul
joogtay. 35 Oo kolkii sanduuqii hore u baxay ayaa Muuse
yidhi, Rabbiyow, sara joogso, oo cadaawayaashaadu ha kala
firdheen, oo kuwa ku necebuna hortaada ha ka carareen. 36
Oo markuu joogsadayna wuxuu yidhi, Rabbiyow, ku soo
noqo kumanyaalka kun ee reer binu Israa'iil.

11 Oo dadkuna waxay ahaayeen sidii kuwo gunuunac
badan, oo wax shar ah ayay Rabbiga dhegihiisa
maqashiiyeen. Oo markii Rabbigu maqlay ayaa cadhadiisii
kululaatay, oo dabkii Rabbiguna dhexdooduu ka qaxmay,
oo xerada meesheedii ugu dambaysay ayuu baabbi'iyey.
2 Markaasaa dadkii waxay u qayliyeen Muuse, kolkaasaa
Muuse Rabbiga baryay, oo dabkiina wuu damay. 3 Oo
meeshaas magaceediina waxaa loo baxshay Tabceeraah,
maxaa yeelay, dabkii Rabbiga ayaa dhexdooda ka qaxmay. 4
Oo dadkii badnaa oo isku darsanaa oo iyaga ku dhex jirayna
aad bay wax ugu jeeleen. Oo reer binu Israa'iilna mar kalay
ooyeen, oo waxay yidhaahdeen, Bal yaa hilib aannu cunno
na siinaya? 5 Annagu waxaannu xusuusan nahay kalluunkii
aannu Masar lacagla'aan uga cuni jirnay, iyo khajaarkii,
iyo batiikhii, iyo basashii cagaarka ahayd, iyo basashii
guduudnayd, iyo toontii. 6 Laakiinse haatan naftayadii
way cunta nacday, oo waxba ma jiraan, oo maannadan
ma ahaane wax kaloo aan fiirsanno ma haysanno. 7
Oo maannaduna waxay u ekayd midhaha koryander la
yidhaahdo, oo midabkeeduna wuxuu u ekaa midabka xabagta
beduliyum la yidhaahdo. 8 Dadku way warwareegi jireen
oo soo ururisan jireen, markaasay mixdin ku daqiijin jireen,
amase mooye ku tumi jireen, oo dheryay ku karsan jireen,
oo moofo bay ka samaysan jireen; oo dhadhankeeduna
wuxuu ahaa sida dhadhanka wax saliid lagu sameeyey.
9 Oo habeennimada markii sayaxu xerada ku soo dego
ayaa maannaduna la soo dhici jirtay. 10 Haddana Muuse
wuxuu maqlay dadkii oo ka dhex ooyaya qabiilooyinkoodii
oo dhan, oo nin waluba teendhadiisa iriddeeduu taagnaa,
markaasaa cadhadii Rabbigu aad u kululaatay, oo Muusena
wuu ka xumaaday. 11 Oo Muuse wuxuu Rabbiga ku yidhi,
Maxaad anoo addoonkaaga ah sida xun iigu gashay? Oo
maxaan raallinimadaada u heli waayay, oo maxaad ii kor
saaraysaa dadkan oo dhan culaabtiisa? 12 Dadkan oo dhan
ma anigaa uuraystay? Oo ma anigaa dhalay markaad igu

leedahay, Iyaga laabtaada ku qaad sida aabbe u qaado
ilmo caanonuug ah, tan iyo dalkii aad awowayaashood ugu
dhaaratay? 13 Bal xaggee baan ka helayaa hilib aan siiyo
dadkan oo dhan? Waayo, iyagu way igu ooyaan oo waxay
igu yidhaahdaan, Hilib aannu cunno na si. 14 Anigu ma
aan qaadi karo dadkan oo dhan, maxaa yeelay, rarkan
aad buu iigu culus yahay. 15 Haddaad sidaas ii gashid,
waan ku baryayaaye, i dil, haddaad raalli iga tahay, oo
yaanan dandarradayda arkin. 16 Markaasaa Rabbigu Muuse
ku yidhi, Waxaad ii soo ururisaa toddobaatan nin oo ah
waayeelladii reer binu Israa'iil oo aad garanaysid inay dadka
waayeello u yihiin iyo saraakiil u talisa, oo waxaad iyaga
keentaa teendhada shirka inay halkaas kula istaagaan. 17
Oo anna waan soo degan doonaa, oo halkaasaan kugula
hadli doonaa, oo waxaan qaadi doonaa ruuxa ku kor jooga,
markaasaan iyaga saari doonaa, oo waxay kula qaadi
doonaan culaabta dadka, si aanad keligaa u qaadin. 18 Oo
dadkana waxaad ku tidhaahdaa, Hilib baad cunaysaane berri
quduus isaga dhiga, waayo, waxaad ku ooydeen Rabbiga
dhegihiisii, oo waxaad tidhaahdeen, Bal yaa hilib aannu
cunno na siinaya? Waayo, markaannu Masar joogi jirnay
baa noo dhaantay. Haddaba Rabbigu hilib buu idin siin
doonaa oo idinna waad cuni doontaan. 19 Oo idinku ma
cuni doontaan maalin keliya, ama laba maalmood, amase
shan maalmood, amase toban maalmood, amase labaatan
maalmood, 20 laakiinse waxaad cuni doontaan bil dhan, jeer
aad sanka dulalkiisa ka keentaan, oo aad ka diiqootaan,
maxaa yeelay, Rabbiga idin dhex jooga ayaad diiddeen oo
aad ku hor ooydeen, oo waxaad tidhaahdeen, Bal maxaannu
Masar uga soo baxnay? 21 Markaasaa Muuse yidhi, Dadka
aan dhex joogaa waa lix boqol oo kun oo nin oo lug ah,
oo adna waxaad tidhi, Waxaan iyaga siinayaa hilib ay bil
dhan cunaan. 22 Ma waxaa loo qalaa ido iyo lo' si ay uga
dhergaan? Mase kalluunka badda ku jira oo dhan baa loo soo
ururiyaa si ay uga dhergaan? 23 Markaasaa Rabbigu Muuse
ku yidhi, War ma gacantii Rabbigaa gaabatay? Haddaba
waad arki doontaa bal in eraygaygu rumoobayo iyo in kale.
24 Markaasaa Muuse baxay oo dadkii u soo sheegay ereygii
Rabbiga, oo wuxuu soo ururiyey toddobaatan nin oo reer
binu Israa'iil waayeello u ah, oo Teendhada hareeraheedii
ayuu isugu keenay. 25 Markaasaa Rabbigu ku soo degtay
daruurtii oo isagii la hadlay, wuxuuna qaaday ruuxii isaga
saarnaa, markaasuu toddobaatankii waayeel saaray, oo
markii ruxuu korkooda ku degay ayay wax sii sheegeen,
laakiinse sidaas mar dambe ma ay yeelin. 26 Laakiinse laba
nin baa xeradii ku dhex hadhay. Mid magiciisa waxaa la
odhan jiray Eldaad, kan kalena magiciisa waxaa la odhan
jiray Meedaad, oo iyagana ruuxii baa ku soo degay, oo
waxay ka mid ahaayeen kuwii la qoray, laakiinse uma ay
bixin Teendhadii; oo iyagu xerada dhexdeedii ayay wax ku
sii sheegeen. 27 Markaasaa nin dhallinyaro ah soo orday oo
Muuse u soo sheegay oo yidhi, Eldaad iyo Meedaad xeradii
bay wax ku sii sheegayaan. 28 Markaasaa Yashuuca ina
Nuun oo Muuse midiidinkiisa ahaa oo raggiisii uu doortay ka
mid ahaa ayaa ku yidhi, Sayidkaygii Muusow, u diid iyaga.
29 Markaasaa Muuse wuxuu isagii ku yidhi, War ma aniga
baad ii xinaasaysaa? Bal may dadka Rabbiga oo dhammu
nebiyo ahaadaan, oo Rabbigu muu iyaga ruuxiisa ku soo
dejiyo! 30 Markaasaa Muuse iyo waayeelladii reer binu
Israa'iilba xerada ku noqdeen. 31 Markaasaa dabayl Rabbiga
ka timid, oo waxay badda ka keentay digaagduur, oo xerada
hareeraheedii ayay ku soo daadisay intii maalin socodkeed
ah oo dhankan ah iyo intii maalin socodkeed ah oo dhanka
kale ah oo xerada ku wareegsan, oo dalka korkiisana waxay
u jireen intii laba dhudhun ah. 32 Markaasaa dadkii kacay oo
maalintaas oo dhan, iyo habeenkii oo dhan, iyo maalintii
dambe oo dhan waxay soo urursadeen digaagduurkii; oo kii
ugu wax yaraa wuxuu soo urursaday toban xomeer, oo waxay
ku kala bixiyeen xerada hareeraheedii. 33 Oo intii hilibkii
ilkahoodii ku dhex jiray, oo aanay weli calalin, ayaa cadhadii
Rabbigu dadkii aad ugu kululaatay, markaasaa Rabbigu
wuxuu dadkii ku dhuftay belaayo weyn. 34 Oo meeshaas
magaceedii waxaa loo bixiyey Qibrood Xatawaah, maxaa
yeelay, halkaasaa lagu aasay dadkii hunguri xumaaday. 35
Markaasay dadkii Qibrood Xatawaah ka guureen, oo waxay
u sodcaaleen Xaseerood, Xaseeroodna way degeen.

**12** Oo Maryan iyo Haaruunna waxay Muuse u xanteen
naagtii reer Kuush oo uu guursaday, maxaa yeelay,
isagu wuxuu guursaday naag reer Kuush. 2 Oo iyagu waxay
yidhaahdeen, War Rabbigu ma Muuse keliyuhuu la hadlay?
Miyuusan annagana nala hadlin? Oo Rabbigu taas wuu
maqlay. 3 Haddaba Muuse wuxuu ahaa ninka ugu wada
qalbi qaboobaa dadkii dunida joogay oo dhan. 4 Markaasaa
Rabbigu dhaqso ula hadlay Muuse iyo Haaruun iyo Maryan,
oo wuxuu ku yidhi, Saddexdiinnuba kaalaya teendhada
shirka. Oo saddexdoodiiba way soo bexeen. 5 Markaasaa
Rabbigu ku soo degtay tiir daruur ah oo istaagay iriddii
teendhadii shirka, oo wuxuu u yeedhay Haaruun iyo Maryan,
kolkaasaa labadoodiiba soo bexeen. 6 Oo wuxuu iyagii ku
yidhi, Haddaba bal hadalladayda maqla. Haddii nebi idinku
dhex jiro, anigoo Rabbiga ah ayaa muujin isku tusi doona,
oo riyo baan kula hadli doonaa. 7 Addoonkayga Muuse
sidaas ma aha, oo isagu aamin buu ku yahay gurigayga oo

dhan. 8 Isaga bayaan baan afkayga ugula hadlayaa, oo
hadal gudcur ah kula hadli maayo, oo wuxuu arki doonaa
Rabbiga qaabkiisa. Haddaba maxaad uga cabsan weydeen
inaad addoonkayga Muuse wax ka sheegtaan? 9 Markaasaa
Rabbigu iyagii aad ugu cadhooday, wuuna ka tegey. 10 Oo
daruurtiina way ka tagtay teendhada korkeedii; oo Maryanna
waxaa ku dhacay baras, oo waxay u caddaatay sida barafka
cad oo kale. Markaasaa Haaruun fiiriyey Maryan oo wuxuu
arkay inay baras qabto. 11 Markaasaa Haaruun Muuse ku
yidhi, Sayidkaygiiyow, waan ku baryayaaye, wixii aannu
nacasnimada u samaynay iyo wixii aannu ku dembaabnay
aawadood dembi ha noo saarin. 12 Waan ku baryayaaye,
yaanay ahaan sidii mid dhintay oo kale oo jidhkiisii badh
baabba'san yahay markuu uurkii hooyadiis ka soo baxay. 13
Markaasaa Muuse Rabbiga u qayliyey, oo wuxuu ku yidhi,
Ilaahow, waan ku baryayaaye, iyada bogsii. 14 Oo Rabbigu
wuxuu Muuse ku yidhi, Haddii aabbeheed wejiga kaga
candhuufo sow ma ay ceebowdeen intii toddoba maalmood
ah? Haddaba xerada ha laga saaro intii toddoba maalmood
ah, oo markaas dabadeedna ha la soo celiyo. 15 Kolkaasaa
Maryan xerada dibadda looga xidhay, oo dadkiina ma guurin
ilamaa Maryan mar kale la soo celiyey. 16 Oo dabadeedna
dadkii Xaseerood way ka guureen, oo waxay degeen cidladii
Faaraan.

**13** Markaasaa Rabbigu Muuse la hadlay oo wuxuu ku
yidhi, 2 War waxaad dirtaa niman soo basaasa dalka
reer Kancaan oo aan reer binu Israa'iil siinayo, oo qabiil
walba waa inaad nin ka dirtaan, oo mid kastaaba ha ahaado
amiir iyaga ku jira. 3 Markaasaa Muuse iyagii ka diray
cidladii Faaraan sidii amarkii Rabbigu ahaa, oo kulligood
waxay ahaayeen rag reer binu Israa'iil madax u ahaa. 4
Oo magacyadoodiina kuwan bay ahaayeen: qabiilkii reer
Ruubeen waxaa ka tegey Shammuuca ina Sakuur. 5 Oo
qabiilkii reer Simecoonna Shaafaad ina Xori. 6 Oo qabiilkii
reer Yahuudahna Kaaleeb ina Yefunneh. 7 Oo qabiilkii reer
Isaakaarna Yigaal ina Yuusuf. 8 Oo qabiilka reer Efrayimna
Hoosheeca ina Nuun. 9 Oo qabiilkii reer Benyaamiinna Faltii
ina Raafuu. 10 Oo qabiilkii reer Sebulunna Gaddii'eel ina
Soodii. 11 Oo qabiilkii reer Yuusuf oo ah reer Manasehna
Gaddii ina Suusii. 12 Oo qabiilkii reer Daanna Cammii'eel
ina Gemallii. 13 Oo qabiilkii reer Aasheerna Setuur ina
Miikaa'eel. 14 Oo qabiilkii reer Naftaalina Naxbii ina Waafsii.
15 Oo qabiilkii reer Gaadna Ge'uu'eel ina Maakii. 16 Intaasu
waa magacyadii nimankii Muuse u diray inay dalka soo
basaasaan. Markaasaa Muuse wuxuu Hoosheeca ina Nuun
u bixiyey Yashuuca. 17 Markaasaa Muuse iyagii u diray
inay dalkii reer Kancaan soo basaasaan, oo wuxuu iyagii ku
yidhi, Jidkan koonfureed xaggiisa u kaca oo buuraha fuula.
18 Oo waxaad soo fiirisaan dalku siduu yahay, iyo dadka
degganu inay xoog badan yihiin iyo inay itaal yar yihiin, iyo
inay tiro yar yihiin iyo inay tiro badan yihiin, 19 iyo dalka ay
deggan yihiin siduu yahay inuu wanaagsan yahay iyo inuu
xun yahay, iyo magaalooyinka ay deggan yihiin siday yihiin,
inay xerooyin deggan yihiin iyo inay qalcado xoog badan ku
jiraan, 20 iyo siduu dalku yahay inuu barwaaqaysan yahay
iyo in kale, iyo inuu dhir leeyahay iyo in kale. Haddaba
dhiirranaada oo dalka midhihiisa keena. Oo wakhtiguna
wuxuu ahaa xilliga uu canabka hore bislaado. 21 Haddaba
iyagii way tageen oo waxay soo basaaseen dalkii tan iyo
cidlada Sin iyo ilaa Rexob oo ku taal meesha Xamaad laga
galo. 22 Oo waxay tageen xagga koonfureed, oo yimaadeen
Xebroon; oo Axiiman iyo Sheeshay iyo Talmay oo reer
Canaaq ahaa ayaa halkaas degganaa. (Oo Xebroon waxaa
la dhisay goor toddoba sannadood ka horraysa intaan la
dhisin Socan oo Masar ku taal.) 23 Oo haddana waxay
yimaadeen dooxadii Eshkol, oo halkaasay ka goosteen laan
rucub canab ahu ku yaal, oo waxay ku qaadeen ul laba nin u
dhexaysa, waxayna keeneen midho rummaan iyo berde ah.
24 Oo meeshaas magaceeda waxaa la odhan jiray Eshkol,
rucubkii canabka ahaa oo ay reer binu Israa'iil halkaas
ka goosteen aawadiis. 25 Oo markay afartan maalmood
dalkii soo basaaseen dabadeed ayay ka soo noqdeen. 26
Markaasay tageen oo Muuse iyo Haaruun iyo shirkii reer
binu Israa'iil oo dhan ugu yimaadeen cidladii Faaraan iyo
tan iyo Qaadeesh, oo iyagii iyo ururkii oo dhan war bay
u keeneen, oo waxay soo tuseen midhihii dalka. 27 Oo
Muuse bay u warrameen oo waxay ku yidhaahdeen, Annagu
dalkii aad noo dirtay waan gaadhnay, oo hubaal wuxuu
la barwaaqaysan yahay caano iyo malab, oo midhihiisiina
waa kuwan. 28 Habase yeeshee dadka dalka degganu waa
xoog badan yihiin, oo magaalooyinkuna deyrar bay leeyihiin,
waana waaweyn yihiin, oo weliba waxaannu halkaas ku
soo aragnay reer Canaaq. 29 Oo reer Camaaleq waxay
deggan yihiin dalka xaggiisa koonfureed, oo reer Xeed iyo
reer Yebuus iyo reer Amorna waxay deggan yihiin buuraha,
oo reer Kancaanna waxay deggan yihiin badda agteeda iyo
Webi Urdun dhinaciisa. 30 Markaasaa Kaaleeb dadkii ku
aamusiiyey Muuse hortiisa, oo wuxuu ku yidhi, War haddiiba
ina keena, aynu dalka qabsannee, waayo, innagu waynu
karaynaa inaynu ka adkaanno. 31 Laakiinse nimankii isaga
raacay waxay yidhaahdeen, War innagu dadkaas kuma kici
karno, waayo, way inaga xoog badan yihiin. 32 Oo iyagu
dalkii ay soo basaaseen ayay reer binu Israa'iil war xun uga

keeneen, oo waxay yidhaahdeen, Dalka aannu dhex marnay
oo soo basaasnay waa dal cuna dadka deggan, oo dadkii
aannu ku aragnay oo dhammuna waa dad aad u dhaadheer.
33 Oo waxaannu halkaas ku aragnay dad waaweyn oo xoog
badan oo ah reer Canaaq oo ka yimid dadkii waaweynaa oo
xoogga badnaa. Waxaannu isula yaraannay sida kabajaan
oo kale, oo hortoodana sidaas oo kalaannu ku ahayn.

**14** Oo shirkii oo dhammuna codkoodii bay kor u qaadeen
oo qayliyeen, oo dadkiina habeenkaas way ooyeen. 2
Oo reer binu Israa'iil oo dhammuna waxay u gunuuseen
Muuse iyo Haaruun, oo shirkii oo dhammu waxay iyagii
ku yidhaahdeen, Waxaa inoo roonayd inaynu dalkii Masar
ku dhimanno! Amase inaynu cidladan ku dhimanno! 3
Bal Rabbigu muxuu inoogu soo kexeeyey dalkan aynu
seefta ku le'anayna? Naagaheenna iyo dhallaankeennu dhac
bay noqonayaan. Sow inaynu Masar ku noqonno inooma
roona? 4 Oo markaasaa midba midkii kale ku yidhi, Kaalaya
aynu madax doorannee oo aynu Masar isaga noqonnee.
5 Markaasaa Muuse iyo Haaruun waxay ku hor dheceen
ururkii shirka reer binu Israa'iil oo dhan. 6 Oo Yashuuca ina
Nuun iyo Kaaleeb ina Yefunneh oo kuwii dalka soo basaasay
ka mid ahaa ayaa dharkoodii iska jeexjeexay, 7 oo waxay la
hadleen shirkii reer binu Israa'iil oo dhan oo ku yidhaahdeen,
War dalkii aannu dhex marnay oo aan soo basaasnay waa
dal aad iyo aad u wanaagsan. 8 Oo haddii Rabbigu inagu
farxo, ayuu dalkaas ina geeyn doonaa, oo wuu ina siin
doonaa dalkaas caanaha iyo malabka la barwaaqaysan. 9
Laakiinse Rabbiga ha ku caasiyoobina, oo ha ka cabsanina
dadka dalka deggan, waayo, waxay inoo yihiin sida kibis oo
kale. Daafacoodii korkooda waa laga qaaday, oo Rabbigu
innaguu inala jiraaye; iyaga ha ka cabsanina. 10 Laakiinse
shirkii oo dhammu waxay yidhaahdeen, Iyaga ha la dhagxiyo.
Markaasaa ammaantii Rabbigu waxay reer binu Israa'iil oo
dhan uga muuqatay teendhadii shirka. 11 Oo Rabbigu wuxuu
Muuse ku yidhi, Dadkanu ilaa goormay i quudhsanayaan?
Oo ilaa goormay i rumaysan waayayaan in kastoo aan
dhexdooda calaamooyinka oo dhan ku sameeyey? 12
Haddaba iyagaan belaayo ku dhufan doonaa, oo waan
dhaxal tiri doonaa, oo waxaan kaa samayn doonaa quruun
iyaga ka weyn oo ka sii xoog badan. 13 Markaasaa Muuse
wuxuu Rabbiga ku yidhi, De taas waxaa maqli doona
Masriyiintii, waayo, dadka itaalkaagaad iyaga kaga soo
dhex bixisay. 14 Oo iyana waxay u sheegi doonaan dadka
dalkan deggan. Iyagu waxay maqleen inaad dadkan dhex
joogto, Rabbiyow, waayo, Rabbiyow, fool ka fool baa laguu
arkay oo daruurtaadii baa iyaga kor taagan, oo maalintii
waad ku hor kacdaa tiir daruur ah, habeenkiina tiir dab
ah. 15 Haddaba haddaad dadkan sidii nin keliya u disho,
quruumihii warkaaga maqlay way hadli doonaan, oo waxay
odhan doonaan, 16 Rabbigu ma uu karin inuu dadkan keeno
dalkii uu ugu dhaartay, sidaas daraaddeed ayuu cidladii
ku laayay. 17 Haddaba waan ku baryayaaye, Sayidow,
xooggaagu wax weyn ha ahaado, sidaad u hadashay oo aad
tidhi, 18 Rabbigu cadho waa u gaabiyaa, oo waa naxariis
badan yahay, oo xumaanta iyo xadgudubka wuu dhaafaa,
oo sinaba uma caddeeyo in kan dembiga galay aanu eed
lahayn, oo xumaantii awowayaashana wuxuu gaadhsiiyaa
carruurtooda tan iyo farcanka saddexaad iyo kan afraad.
19 Haddaba waan ku baryayaaye, sida ay naxariistaadu
u weyn tahay oo aad dadkan u cafiyi jirtay tan iyo dalkii
Masar iyo ilaa haddeer dadkan xumaantooda saamax. 20
Markaasaa Rabbigu yidhi, Sidaad u tidhi, waan u saamaxay,
21 laakiinse sida runta ah anigu waan noolahay, oo dunida
oo dhammuna waxay ka buuxsami doontaa ammaanta
Rabbiga. 22 Kulli dadkii ammaantayda arkay, oo arkay
calaamooyinkii aan ku sameeyey Masar iyo cidladii, oo weliba
tobankan jeer i jirrabay oo aanay codkaygiina dhegaysan,
23 hubaal ma ay arki doonaan dalkii aan awowayaashood
ugu dhaartay, oo intoodii i quudhsatayna midna ma arki
doono. 24 Laakiinse addoonkayga Kaaleeb wuxuu lahaa
ruux kaleeto oo dhammaan ahaan buu ii raacay, oo sidaas
daraaddeed isaga waan geeynayaa dalkii uu tegey, oo
farcankiisuna way lahaan doonaan. 25 Haddaba dooxada
waxaa deggan reer Camaaleq iyo reer Kancaan. Idinku
berrito dib u noqda, oo waxaad tagtaan cidladii ku taal jidka
loo maro Badda Cas. 26 Markaasaa Rabbigu la hadlay
Muuse iyo Haaruun, oo wuxuu ku yidhi, 27 Ilaa goormaan u
adkaysanayaa shirkan sharka ah oo ii gunuusa? Waxaan
maqlay gunuuskii ay reer binu Israa'iil ii gunuuseen. 28
Waxaad iyaga ku tidhaahdaa, Rabbigu wuxuu leeyahay,
Noloshaydaan ku dhaartaaye, hubaal sidaad dhegahayga
ugu hadasheen ayaan idinku samaynayaa. 29 Meydadkiinnu
waxay ku dhici doonaan cidladan, oo kulli kuwiinna la tiriyey
sidii tiradiinnu ahayd oo ah intii labaatan sannadood jirtay
ama ka sii weynayd oo aniga ii gunuusay, 30 hubaal idinku
geli maysaan dalkii aan ku dhaartay inaan idin dejinayo,
Kaaleeb ina Yefunneh iyo Yashuuca ina Nuun mooyaane. 31
Laakiinse yaryarkiinna aad tidhaahdeen, Waa la dhacayaa,
iyagaan keeni doonaa, oo iyagu way baran doonaan dalkii
aad diiddeen. 32 Laakiinse idinka meydadkiinnu way ku
dhici doonaan cidladan. 33 Oo carruurtiinnuna afartan
sannadood ayay cidlada ku warwareegi doonaan, oo ilaa
meydadkiinnu ay cidlada ku baabba'aan iyagu waxay sidi

doonaan daacadnimola'aantiinna. 34 Oo maalmihii aad dalka
ku soo basaasteen oo afartan maalmood ahaa, maalintiiba
sannad ayaad dembiyadiinna u qaadanaysaan, oo idinku
xumaantiinna waad qaadanaysaan xataa afartan sannadood,
oo waxaad ogaan doontaan diidniintayda. 35 Anigoo Rabbiga
ah ayaa sidaas ku hadlay, oo hubaal waxan oo dhan ayaan
ku samaynayaa shirkan sharka ah ee iiga wada ururay
oo dhan. Cidladan ayay ku baabbi'i doonaan oo ku wada
dhiman doonaan. 36 Oo nimankii Muuse u diray inay dalka
soo basaasaan oo soo noqday oo shirka oo dhan ka dhigay
inay isaga u gunuusaan markay dalkii war xun ka keeneen,
37 nimankaas oo war xun dalkii ka keenay ayaa belaayadii ku
dhintay Rabbiga hortiisa. 38 Laakiinse Yashuuca ina Nuun
iyo Kaaleeb ina Yefunneh ayaa nolol kaga hadhay nimankii
tegey inay dalka soo basaasaan. 39 Markaasaa Muuse
hadalkaas reer binu Israa'iil oo dhan u sheegay, kolkaasaa
dadkii aad u baroorteen. 40 Markaasaa aroor hore kaceen,
oo buurta dhaladeeday fuuleen, oo waxay yidhaahdeen,
Bal eeg, waa na kan, waanan u kacaynaa meeshii Rabbigu
noo ballanqaaday, maxaa yeelay, waannu dembaabnay. 41
Kolkaasaa Muuse yidhi, War Rabbiga amarkiisa maxaad
ugu xadgudbaysaan, waayo, taasu faa'iido idiinma lahaan
doonto? 42 Halkaas ha u kicina, waayo, Rabbigu idinma
dhex joogo ee yaan cadaawayaashiinnu idin layn. 43 Waayo,
halkaas waxaa idinka horreeya reer Camaaleq iyo reer
Kancaan, oo seeftaad ku le'an doontaan, maxaa yeelay,
Rabbiga lasocodkiisii dib baad uga noqoteen, oo sidaas
daraaddeed Rabbigu idinla jiri maayo. 44 Laakiinse iyagii
waxay ku sii adkaysteen inay buurta dhaladeedii fuulaan,
habase yeeshee Muuse iyo sanduuqii axdiga Rabbigu
xeradii kama ay bixin. 45 Kolkaasay reer Camaaleq iyo
reer Kancaan oo buurta degganaa hoos u degeen, oo intay
laayeen ayay tan iyo Xormaah eryadeen.

**15** Markaasaa Rabbigu Muuse la hadlay oo wuxuu ku
yidhi, 2 Reer binu Israa'iil la hadal oo waxaad ku
tidhaahdaa, Markaad gaadhaan dalka rugtiinna ah oo aan
idin siinayo, 3 haddaad doonaysaan inaad Rabbiga qurbaan
dab ugu bixisaan, kaasoo ah qurbaan la gubo, amase
allabari aad nidar ku samaynaysaan, amase qurbaan aad
ikhtiyaar ku bixisaan, amase iidihiinna joogtada ah inaad
caraf udgoon Rabbiga uga bixisaan lo'da ama idaha, 4
haddaba kii wax bixinayaa qurbaankiisa ha ku bixiyo Rabbiga
aawadiis qurbaan hadhuudh ah eefaah toban meelood loo
qaybiyey meeshiis oo bur wanaagsan ah oo lagu daray hiin
rubuceed oo saliid ah; 5 oo khamri ah qurbaanka cabniinka
hiin rubuceed waa inaad qurbaanka la gubo ama allabariga
ula diyaarisaan wan kasta. 6 Oo wankii weynna waxaad
qurbaan hadhuudh ah u diyaarisaan eefaah toban meelood
loo qaybiyo labadiis meelood oo bur wanaagsan ah oo hiin
saddex meelood meel saliid ah lagu daray. 7 Oo qurbaanka
cabniinkana waxaad u bixisaan hiin saddex meelood meel
khamri ah oo Rabbiga u ah caraf udgoon. 8 Oo markaad
dibi u bixinaysid allabariga la gubo amase allabari aad
nidar ku samaynaysid, amase qurbaanno nabaadiino oo
aad Rabbiga u bixinayso, 9 markaas eefaah toban meelood
loo qaybiyey saddexdiis meelood oo bur wanaagsan ah
oo lagu daray hiin nuskeed saliid ah qurbaan hadhuudh
ha ula bixiyo dibiga. 10 Qurbaanka cabniinkana waa inaad
u bixisaa hiin nuskeed khamri ah, kaas oo ah qurbaan
dab lagu sameeyo oo caraf udgoon Rabbiga u ah. 11 Oo
sidaas ha loo sameeyo dibi kasta, ama wan kasta oo weyn,
ama wan kasta oo yar, ama orgi kasta oo yar. 12 Intaad
diyaarisaan sida tiradu tahay mid kasta u sameeya. 13
Inta waddaniga ah oo dhammu waxyaalahan sidaas ha u
sameeyeen markay bixinayaan qurbaan dab lagu sameeyo
oo caraf udgoon Rabbiga u ah. 14 Oo haddii shisheeye
idinla deggan yahay ama mid kasta oo idin dhex jooga
qarniyadiinna oo dhan, hadduu doonayo inuu qurbaan dab
lagu sameeyo Rabbiga ugu bixiyo caraf udgoon, sidaad
idinku yeeshaan isna waa inuu yeelaa. 15 Oo ururkiinna oo
dhammu waa inaad idinka iyo shisheeyaha idinla degganu
lahaataan qaynuun keliya, kaas oo ahaanaya qaynuun ab
ka ab. Waayo, sidaad idinku tihiin, shisheeyuhuna waa inuu
Rabbiga hortiisa sidaas oo kale ku ahaadaa. 16 Oo idinka
iyo shisheeyihii idinla degganuba waa inaad lahaataan isku
sharci iyo isku qaynuun. 17 Markaasaa Rabbigu haddana
Muuse la hadlay oo wuxuu ku yidhi, 18 Reer binu Israa'iil la
hadal oo waxaad ku tidhaahdaa, Dalka aan idin geeynayo
markaad gaadhaan, 19 oo aad dalka cuntadiisa cuntaan
waa inaad Rabbiga u bixisaan qurbaan sare loo qaado. 20
Cajiinkiinna ugu horreeya waa inaad ka bixisaan moofo ah
qurbaan sare loo qaado, oo waa inaad taas sare u qaaddaan
sidaad sare ugu qaaddaan qurbaanka hadhuudhka ee laga
qaado meesha hadhuudhka lagu tumo. 21 Oo cajiinkiinna
ugu horreeya waa inaad Rabbiga uga bixisaan qurbaan sare
loo qaado tan iyo ab ka ab. 22 Oo markaad qaldantaan oo
aydaan wada xajin amarradan oo dhan oo uu Rabbigu Muuse
kula hadlay, 23 xataa wixii uu Rabbigu Muuse idinkaga
amray oo dhan tan iyo maalintii Rabbigu amarka bixiyey
ilaa tan iyo ab ka ab, 24 markaas haddii qaladkii kama' loo
sameeyey iyadoo aan shirku ogayn, shirka oo dhammu
waa inay qurbaan la gubo aawadiis dibi yar Rabbiga ugu
bixiyaan caraf udgoon, isaga iyo qurbaankiisii hadhuudhka,

iyo qurbaankiisii cabniinka, iyo orgi ah qurbaanka dembiga,
oo ha loo bixiyo sida qaynuunku leeyahay. 25 Oo shirka
reer binu Israa'iil oo dhan waa in wadaadku u kafaaro
gudaa, oo markaas iyaga waa la cafiyayaa, maxaa yeelay,
waxay ahayd qalad kama' loo sameeyey, oo iyana waxay
qaladkoodii u keeneen qurbaankoodii kaas oo ahaa qurbaan
dab loogu sameeyey Rabbiga, iyo qurbaankii dembigooda
Rabbiga hortiisa loogu bixiyey. 26 Oo shirka reer binu Israa'iil
oo dhan iyo shisheeyaha iyaga dhex degganba waa la cafiyi
doonaa, waayo, qaladkaas dadka oo dhammu kama' bay u
sameeyeen. 27 Oo haddii qof keliya kama' u dembaabo,
isagu waa inuu qurbaanka dembiga u bixiyaa ceesaan gu jir
ah. 28 Oo qofkii qaldamay waa in wadaadku u kafaaro gudaa
naftiisa markuu qofkaas kama' ugu dembaabo Rabbiga
hortiisa, si uu isaga u kafaaro gudo, oo markaas isaga
waa la cafiyi doonaa. 29 Waa inaad isku sharci keliya u
yeeshaan kii kama' u qaldama ha ahaadee waddanigii
reer binu Israa'iil ku dhex dhashay ama shisheeyihii iyaga
dhex degganba. 30 Laakiinse qofkii gacan kibir leh gaf ku
sameeyaa hadduu waddani yahay iyo hadduu shisheeye
yahayba kaasu wuxuu caayay Rabbiga, oo qofkaas waa in
dadkiisa laga gooyaa. 31 Qofkaas dhammaantiis waa in laga
gooyaa, oo dembigiisuna waa inuu korkiisa saarnaadaa,
maxaa yeelay, isagu Rabbiga ereygiisuu quudhsaday, oo
amarkiisiina wuu jebiyey. 32 Oo intii reer binu Israa'iil cidladii
joogeen, waxay heleen nin maalintii sabtida qoryo guranaya.
33 Oo kuwii helay isagoo qoryo guranaya waxay u keeneen
Muuse iyo Haaruun iyo shirkii oo dhan. 34 Oo markaasay
xidheen, maxaa yeelay, waxa isaga lagu samayn lahaa
ayaan weli la caddayn. 35 Markaasaa Rabbigu Muuse ku
yidhi, Ninka hubaal waa in la dilaa, oo shirka oo dhammu waa
inay isaga xerada dibaddeeda ku dhagxiyaan. 36 Markaasaa
shirkii oo dhammu waxay isagii keeneen xerada dibaddeedii,
kolkaasay dhagxiyeen oo wuu dhintay, sidii Rabbigu Muuse
ku amray. 37 Kolkaasaa Rabbigu Muuse la hadlay, oo
wuxuu ku yidhi, 38 Reer binu Israa'iil la hadal, oo waxaad
iyaga ku amartaa inay iyagu ab ka ab farqiyaan darfaha
dharkooda, iyo inay faraqa daraf kasta u yeelaan xadhig
buluug ah. 39 Oo wuxuu idiin noqonayaa faraq aad fiirsataan
oo aad Rabbiga amarradiisii oo dhan ku xusuusataan inaad
samaysaan, si aydaan u raacin qalbigiinna iyo indhihiinna
aad daacadnimola'aan ku raaci jirteen, 40 laakiinse aad
xusuusataan oo aad samaysaan amarradayda oo dhan, oo
aad quduus uu ahaataan Ilaahiinna. 41 Anigu waxaan ahay
Rabbiga Ilaahiinna ah oo dalkii Masar idiinka soo bixiyey
inuu Ilaah idiin ahaado. Aniga ayaa ah Rabbiga Ilaahiinna
ah.

**16** Haddaba Qorax ina Isehaar oo ahaa ina Qohaad, oo
ka sii ahaa reer Laawi, isaga iyo Daataan iyo Abiiraam
oo ahaa ilma Elii'aab, iyo Oon oo ahaa ina Feled oo reer
Ruubeen ahaa ayaa rag watay, 2 oo waxay ku hor kaceen
Muuse iyaga iyo reer binu Israa'iil qaarkood oo ahaa laba
boqol iyo konton amiir oo shirka loo doortay oo wada caan
ahaa. 3 Oo iyana way wada urureen oo gees ka noqdeen
Muuse iyo Haaruun, oo waxay iyagii ku yidhaahdeen, Idinku
filan, maxaa yeelay, shirka oo dhan qof kastaaba waa
quduus, oo Rabbiguna waa dhex joogaa iyaga. Haddaba
maxaad Rabbiga ururkiisa isaga sara marisaan? 4 Oo
Muusena markuu taas maqlay ayuu wejiga dhulka dhigay.
5 Markaasuu la hadlay Qorax iyo guutadiisii oo dhan oo
wuxuu ku yidhi, Berri subax ayaa Rabbigu muujin doonaa
kuwa ah kuwiisa iyo kii quduus ah, wuuna soo dhowayn
doonaa; oo kii uu isagu dooranayana wuu isu soo dhowayn
doonaa. 6 Haddaba Qorax iyo guutadiisa oo dhammay, sidan
yeela, oo waxaad qaadataan idammo, 7 oo berrito Rabbiga
hortiisa iyaga dab ku shuba oo foox ku shida, oo kolkaas
ninkii Rabbigu doorto, wuxuu ahaan doonaa quduus. Idinku
filan reer Laawiyow. 8 Markaasaa Muuse wuxuu Qorax ku
yidhi, Haddaba maqla reer Laawiyow. 9 Ma idinla yar tahay
in Ilaaha reer binu Israa'iil idiinka soocay shirka reer binu
Israa'iil inuu idin soo dhowaysto si aad u samaysaan hawsha
taambuugga Rabbiga oo aad shirka hortiisa istaagtaan oo
u adeegtaan, 10 iyo inuu weliba idinka iyo walaalihiinna
reer Laawi oo dhanba soo dhowaystay? Oo haddana ma
waxaad doonaysaan wadaadnimada? 11 Haddaba adiga
iyo guutadaada oo dhammu waxaad isu soo urursateen oo
aad gees ka tihiin Rabbiga. Balse maxaa dhacay oo aad
Haaruun ugu gunuustaan? 12 Markaasaa Muuse u cid diray
Daataan iyo Abiiraam oo ahaa ilma Elii'aab, oo iyana waxay
yidhaahdeen, Iman mayno. 13 Ma wax yar baa inaad naga
soo kaxaysay dal caano iyo malab la barwaaqaysan, si aad
noogu dishid cidlada dhexdeeda, oo aad weliba annaga
amiir isaga kaayo dhigtid? 14 Oo weliba nama aadan geeyn
dal caano iyo malab la barwaaqaysan, oo namana aadan
siin dhul iyo beero canab ah oo aan dhaxalno. War ma
waxaad doonaysaa inaad dadkan indhaha ka riddo? Annagu
iman mayno. 15 Markaasaa Muuse aad u cadhooday, oo
wuxuu Rabbiga ku yidhi, Adigu qurbaankooda ha aqbalin.
Anigu iyaga dameerna kama qaadan, midkoodna waxba
ma yeelin. 16 Markaasaa Muuse wuxuu Qorax ku yidhi,
Berrito adiga iyo guutadaaduba Rabbiga hortiisa kaalaya,
adiga iyo iyaga iyo Haaruunba. 17 Oo idinka nin waluba
idankiisa ha qaato oo foox ha ku shubo, oo ninkiin kastaaba
idankiisa Rabbiga ha hor keeno, kuwaasoo wada ah laba

boqol iyo konton idan, oo weliba adiga iyo Haaruunna
idammadiinna soo qaata. 18 Oo iyana nin waluba idankiisii
buu soo qaatay, oo dab bay ku shubeen, fooxna way
saareen, kolkaasay Muuse iyo Haaruun la istaageen iridda
teendhadii shirka. 19 Markaasaa Qorax soo shirsaday shirkii
oo dhan oo iyaga ka gees ah, oo wuxuu soo tubay iridda
teendhadii shirka. Oo shirkii oo dhan waxaa u muuqatay
ammaantii Rabbiga. 20 Markaasaa Rabbigu Muuse iyo
Haaruun la hadlay oo wuxuu ku yidhi, 21 Idinku shirkan
dhan isaga sooca aan iyaga daqiiqad ku baabbi'iyee. 22
Markaasay wejiga dhulka dhigeen, oo waxay yidhaahdeen,
Ilaahow, adigoo ah Ilaaha binu-aadmiga oo dhan ruuxoodow,
haddaba nin keliyahaa dembaabaye ma dadka shirka oo
dhan baad u cadhoonaysaa? 23 Markaasaa Rabbigu Muuse
la hadlay oo wuxuu ku yidhi, 24 Shirka la hadal, oo waxaad
ku tidhaahdaa, War, ka ag kaca taambuugyada Qorax, iyo
Daataan iyo Abiiraam. 25 Markaasaa Muuse wuxuu u kacay
Daataan iyo Abiiraam, oo waayeelladii reer binu Israa'iilna
isagay soo raaceen. 26 Markaasuu shirkii la hadlay, oo
wuxuu ku yidhi, Waan idin baryayaaye, Isaga fogaada
nimankan sharka ah teendhooyinkooda, oo waxay iyagu
leeyihiinna ha taabanina, yaan dembiyadooda aawadood
laydiin baabbi'ine. 27 Haddaba waxay ka kaceen dhinac
kasta ee taambuugyadii Qorax iyo Daataan iyo Abiiraam.
Markaasay Daataan iyo Abiiraam soo bexeen, oo waxay
istaageen iridda teendhooyinkoodii, iyaga iyo naagahoodii,
iyo wiilashoodii, iyo dhallaankoodiiba. 28 Markaasaa Muuse
wuxuu yidhi, Tanaad ku ogaanaysaan in Rabbigu ii soo
diray inaan waxyaalahan oo dhan sameeyo, waayo, anigu
maankayga uun kama samayn. 29 Haddii nimankanu ay
u dhintaan sida caadiga u ah dadka oo dhan, ama iyaga
loo booqdo sida dadka oo dhan loo soo booqdo, markaas
Rabbigu ima uu soo dirin. 30 Laakiinse haddii Rabbigu wax
cusub sameeyo, oo dhulku afka kala qaado oo uu iyaga
iyo waxay leeyihiin oo dhan liqo, oo haddii iyagoo noolnool
ay She'ool ku dhaadhacaan, de markaas waxaad garan
doontaan in nimankanu Rabbiga quudhsadeen. **(Sheol h7585)**
31 Oo kolkuu dhammeeyey waxyaalahaas uu ku hadlay oo
dhan, ayaa dhulkii iyaga ka hooseeyey kala dillaacay, 32 oo
dhulku afka kala qaaday oo liqay iyagii iyo reerahoodii, iyo
dadkii Qorax oo dhan, iyo alaabtoodii oo dhan. 33 Haddaba
iyagii iyo wixii ay lahaayeen oo dhammuba iyagoo noolnool
ayay She'ool ku dhaadhaceen, markaasaa dhulkii ku dul
xidhmay, oo iyana shirkii way ka halligmeen. **(Sheol h7585)** 34
Markaasaa reer binu Israa'iilkii hareerahooda joogay waxay
ka carareen qayladoodii, waayo, waxay isyidhaahdeen,
War aarmaa dhulku innagana ina liqaa. 35 Markaasaa
dab Rabbiga xaggiisa ka yimid oo baabbi'iyey laba boqol
iyo kontonkii nin oo fooxa bixiyey. 36 Markaasaa Rabbigu
Muuse la hadlay oo wuxuu ku yidhi, 37 La hadal Elecaasaar
ina Haaruun wadaadka ah, oo u sheeg inuu idammada
dabka ka bixiyo, adna dabka xagga shishe ku kala firdhi,
waayo, iyagu waa quduus. 38 Oo idammada nimankan
naftooda ku dembaabay ha laga dhigo dahaadh tuman
oo meesha allabariga lagu dahaadho; waayo, Rabbiga
hortiisay ku bixiyeen, oo sidaas daraaddeed iyagu waa
quduus; oo calaamo bay reer binu Israa'iil u noqon doonaan.
39 Markaasaa wadaadkii Elecaasaar wuxuu soo qaaday
idammadii naxaasta ahaa oo ay kuwii gubtay bixiyeen, oo
inta la tumay ayaa meesha allabariga dahaadh looga dhigay,
40 inay taasu reer binu Israa'iil xusuus u noqoto, si uusan
shisheeye aan Haaruun farcankiisa ahaynu Rabbiga hortiisa
ugu soo dhowaan inuu foox u bixiyo, si uusan u noqon
sidii Qorax iyo guutadiisa, sidii Rabbigu isaga ugula hadlay
Muuse. 41 Laakiinse subaxdii dambe shirkii reer binu Israa'iil
oo dhammu way u gunuuseen Muuse iyo Haaruun, oo waxay
ku yidhaahdeen, Idinku dadkii Rabbiga waad layseen. 42 Oo
kolkii shirkii oo dhammu ay soo urureen oo ay Muuse iyo
Haaruun gees ka noqdeen, waxay soo fiiriyeen teendhadii
shirka xaggeedii, oo bal eeg, daruurtii baa qarisay, oo waxaa
muuqatay Rabbiga ammaantiisii. 43 Markaasaa Muuse iyo
Haaruun waxay yimaadeen teendhadii shirka horteeda. 44
Oo Rabbigu Muuse la hadlay oo wuxuu ku yidhi, 45 Adigu
shirkan ka soo kac, aan iyaga daqiiqad ku baabbi'iyee.
Oo iyana markaasay wejiga dhulka dhigeen. 46 Kolkaasaa
Muuse wuxuu Haaruun ku yidhi, War idankaaga qaad oo
meesha allabariga dab kaga soo shubo, oo foox ku rid, oo
haddiiba shirka u qaad, oo iyaga u kafaaro gud, waayo,
cadho ayaa Rabbiga ka soo baxday, oo belaayadii way
bilaabatay. 47 Markaasaa Haaruun qaaday sidii Muuse ku
hadlay, oo shirkuu ku dhex orday, oo bal eeg, belaayadiina
dadka way ku dhex bilaabatay; oo fooxii wuu shiday, dadkiina
buu u kafaaro guday. 48 Markaasuu isdhex taagay kuwii
dhintay iyo kuwii noolaa; oo belaayadiina way joogsatay.
49 Haddaba kuwii belaayada ku dhintay waxay ahaayeen
afar iyo toban kun iyo toddoba boqol, oo aan lagu tirin kuwii
ku dhintay xaalkii Qorax. 50 Markaasaa Haaruun Muuse
ugu noqday iriddii teendhadii shirka; oo belaayadiina way
joogsatay.

17 Markaasaa Rabbigu Muuse la hadlay, oo wuxuu ku
yidhi, 2 Reer binu Israa'iil la hadal, oo iyaga ulo ka
qaad. Qabiil kastaba ul ka qaad; amiirradooda oo dhan sida
ay qabiilooyinkoodu kala yihiin laba iyo toban ulood ka kala
qaad. Oo nin walba magiciisa ushiisa ku qor. 3 Usha reer

Laawi waxaad ku qortaa magaca Haaruun. Qabiilooyinkooda
madaxdooda mid kastaaba waa inuu ul lahaadaa. 4 Oo waa
inaad iyaga hor dhigtaa maragga teendhada shirka ku yaal,
taasoo ah meesha aan idinkula kulmo. 5 Oo markaas ninkii
aan doorto ushiisu way magooli doontaa, oo anna hortayda
waan ka joojin doonaa gunuuska ay reer binu Israa'iil adiga
kuu gunuusaan. 6 Markaasaa Muuse reer binu Israa'iil la
hadlay, oo amiirradoodii oo dhammu waxay isagii siiyeen
ulo, oo amiir kastaaba mid buu siiyey siday qabiilooyinkoodu
ahaayeen, intaasu waxay ahayd laba iyo toban ulood; oo
ushii Haaruunna ulahooday ku dhex jirtay. 7 Markaasaa
Muuse ulihii dhigay Rabbiga hortiisa teendhadii maragga
gudaheeda. 8 Maalintii dambe waxaa noqotay in Muuse
galay teendhadii maragga, oo bal eeg, wuxuu arkay ushii
Haaruun oo reer Laawi oo magooshay; way magooshay,
wayna ubxisay, oo waxay dhashay yicib bisil. 9 Markaasaa
Muuse ulihii ka soo qaaday Rabbiga hortiisa oo wuxuu u
keenay reer binu Israa'iil oo dhan, oo way fiiriyeen oo nin
waluba ushiisii buu qaatay. 10 Markaasaa Rabbigu Muuse
ku yidhi, Usha Haaruun dib ugu celi maragga hortiisa in
iyada loo haysto calaamo ka gees ah dadka caasiya, inaad
iga joojisid gunuuskooda ay ii gunuusaan, yaanay iyagu
dhimane. 11 Oo sidaasaa Muuse yeelay. Sidii Rabbigu
isaga ugu amray ayuu u sameeyey. 12 Markaasay reer binu
Israa'iil Muuse la hadleen, oo waxay ku yidhaahdeen, War
bal eeg, waannu baabba'aynaa, oo waannu halligmaynaa,
kulligayo waannu wada halligmaynaaye. 13 Mid kasta oo
soo dhowaada oo u soo dhowaadaa taambuugga Rabbiga
wuu dhiman doonaa. Haddaba kulligayo miyaannu wada
baabba'aynaa?

**18** Markaasaa Rabbigu Haaruun ku yidhi, Adiga iyo
wiilashaada iyo qabiilkaagu waxaad qaadi doontaan
dembiga meesha quduuska ah, oo adiga iyo wiilashaada kula
jiraa waxaad qaadi doontaan dembiga wadaadnimadiinna. 2
Oo walaalahaa oo ah qabiilka reer Laawi, qabiilkaas oo ah
kan aabbahaa, la soo dhowow si ay kuugu darmadaan, oo
ay kuugu adeegaan, laakiinse adiga iyo wiilashaada kula
jiraa waa inaad teendhada maragga hor joogtaan. 3 Oo
iyagu waa inay dhawraan amarkaaga iyo hawsha teendhada
oo dhan, laakiinse waa inaanay u soo dhowaan alaabta
meesha quduuska ah iyo meesha allabariga, yaanay iyaga
iyo idinka toona dhimanine. 4 Oo iyagu ha idinku darmadeen
oo ha dhawreen teendhada shirka, iyo hawsha teendhada
loo sameeyo oo dhan; oo shisheeyena yaanu idiin soo
dhowaan. 5 Oo inaan mar dambe cadho ku dhicin reer
binu Israa'iil idiinku waa inaad dhawrtaan hawsha meesha
quduuska ah iyo hawsha meesha allabariga. 6 Oo bal eeg,
anna walaalihiin reer Laawi ayaan kala dhex baxay reer binu
Israa'iil, oo waxay idiin yihiin hadiyad Rabbiga loo siiyey inay
teendhada shirka ka adeegaan. 7 Oo adiga iyo wiilashaada
kula joogaaba waa inaad wadaadnimadiinna u dhawrtaan
waxyaalaha meesha allabariga oo dhan, iyo waxyaalaha
daaha ka shisheeya oo dhan, oo waa inaad adeegtaan.
Wadaadnimada ayaan idiin siiyey sida hawl hadiyad ah; oo
shisheeyihii soo dhowaada waa in la dilaa. 8 Markaasaa
Rabbigu Haaruun ku yidhi, Bal eeg, anna adigaan ku siiyey
amarka qurbaannadayda sare loo qaado, kuwaas oo ah
waxyaalaha quduuska ah oo reer binu Israa'iil oo dhan.
Subkidda aawadeed ayaan adiga iyo wiilashaada u siiyey
qayb joogto ah weligeed. 9 Kulli waxyaalaha aad u quduuska
ah oo dabka laga reebay oo aad lahaan doonto waa kuwan:
mid kasta oo qurbaankooda ah, xataa qurbaankooda kasta
ee hadhuudhka ah, iyo qurbaankooda kasta ee dembiga, iyo
qurbaankooda kasta ee xadgudubka, oo ay ii bixinayaan,
adiga iyo wiilashaadaba ayay aad u quduus idiin ahaan
doonaan. 10 Oo sida waxyaalaha aad u quduuska ah waa
inaad u cuntaa, oo mid kasta oo lab ahu wax ha ka cuno.
Taasu waa inay quduus kuu ahaataa. 11 Oo adigaa iska
leh qurbaanka sare loo qaado oo hadiyaddooda ah, oo
ah qurbaannada la ruxruxo ee reer binu Israa'iil oo dhan.
Kuwaas adiga iyo wiilashaada iyo gabdhahaaga kula jooga
ayaan u siiyey qayb joogto ah weligeed. Oo mid kasta oo
daahir ah oo gurigaaga joogaaba wax ha ka cuno. 12 Oo
saliidda inteeda ugu wanaagsan oo dhan iyo canabka iyo
hadhuudhka intooda ugu wanaagsan oo dhan kuwaasoo
ah midhaha ugu horreeya oo ay Rabbiga siiyaanba, ayaan
adiga ku siiyey. 13 Midhaha ugu horreeya oo dalkooda oo
dhan, oo ay Rabbiga u keenaan, adigaa iska lahaan doonta;
oo mid kasta oo daahir ah oo gurigaaga joogaaba wax ha
ka cuno. 14 Oo wax kasta oo ay reer binu Israa'iil gooni u
soocaan waa inay kuwaaga ahaadaan. 15 Oo wax kasta
oo maxal furo oo Rabbiga loo bixiyo, dad iyo duunyoba,
waa inay kuwaaga ahaadaan, habase yeeshee dadka
curadkiisa kolleyba waa inaad madax furtaa, oo xoolaha
aan daahirka ahayn curadyadoodana waa inaad madax
furtaa. 16 Oo kuwa la madax furayo, markay bil jiraan waa
inaad ku madax furtaa, sidaad u qiimayso, lacag ah shan
sheqel oo le'eg sheqelka meesha quduuska ah (kaasu waa
labaatan geeraah). 17 Laakiinse dibigii curad ah, iyo curadka
idaha, iyo curadka riyaha midnaba yaan la madax furin,
iyagu waa quduus; haddaba dhiiggooda waa inaad meesha
allabariga ku rushaysaa, oo baruurtoodana waa inaad u
gubtaa qurbaan dab lagu gubo oo Rabbiga caraf udgoon u

ah. 18 Oo hilibkoodana waa inuu kaaga ahaadaa, oo sidii
sakaarkii la ruxruxo iyo bowdadii midig adigaa iska leh. 19
Oo waxyaalaha quduuska ah oo dhan qurbaannadooda
sare loo qaado oo ay reer binu Israa'iil Rabbiga u bixiyaan
ayaan adiga iyo wiilashaada iyo gabdhahaaga kula jooga u
siiyey qayb joogto ah weligeed. Oo taasu waa axdi cusbo
ah oo weligiis Rabbiga ku hor yaal, oo uu idinla dhigtay
adiga iyo farcankaaga kula jiraba. 20 Markaasaa Rabbigu
Haaruun ku yidhi, Adigu dalkooda dhaxal kuma lahaan
doonto, oo dhexdoodana innaba qayb kuma yeelan doonto.
Aniga ayaa reer binu Israa'iil dhexdooda ku ah qaybtaadii
iyo dhaxalkaagiiba. 21 Oo bal eeg, reer Laawina waxaan
dhaxal u siiyey meeltobnaadka ay reer binu Israa'iil oo dhan
bixiyaan; taasu waa hawshooda ay qabtaan abaalgudkeedii,
taasoo ah hawsha teendhada shirka. 22 Oo hadda ka dib
waa inaan reer binu Israa'iil u soo dhowaan teendhada shirka
yaanay dembi qaadine oo dhimane. 23 Laakiinse reer Laawi
waa inay teendhada shirka ka adeegaan, oo ay dembigooda
qaadaan: oo taasu waa inay idiin ahaataa qaynuun weligiin
ab ka ab ah, oo iyagu reer binu Israa'iil dhexdooda dhaxal
kuma yeelan doonaan. 24 Waayo, waxaan reer Laawi dhaxal
u siiyey meeltobnaadka ay reer binu Israa'iil Rabbiga ugu
bixiyaan qurbaan sare loo qaado, oo sidaas daraaddeed
waxaan iyaga ku idhi, Reer binu Israa'iil dhexdooda dhaxal
kuma lahaan doontaan. 25 Markaasaa Rabbigu Muuse la
hadlay oo wuxuu ku yidhi, 26 Weliba waxaad la hadashaa
reer Laawi oo ku tidhaahdaa, Markaad reer binu Israa'iil
dhaxal uga qaadataan meeltobnaadka aan idinka siiyey,
markaas waa inaad Rabbiga uga bixisaan qurbaan sare
loo qaado, oo ah meeltobnaadka meeltobnaadkiisa. 27 Oo
qurbaankiinna sare loo qaado wuxuu idiin tirsanaan doonaa
sidii isagoo ah hadhuudhka meesha lagu tumo, iyo sida
buuxsanaanta macsaradda canabka. 28 Oo sidaas waa
inaad idinku qurbaan sare loo qaado Rabbiga uga bixisaan
meeltobnaadyadiinna oo dhan oo aad ka qaadataan reer
binu Israa'iil, oo waa inaad Rabbiga qurbaankiisii sare loo
qaado ka siisaan wadaadka Haaruun ah. 29 Oo hadiyadaha
aad heshaan oo dhanba waa inaad ka bixisaan qurbaan
kasta oo Rabbiga oo sare loo qaado intooda ugu wanaagsan
oo ah inta ugu wada quduusan. 30 Oo sidaas daraaddeed
waxaad iyaga ku tidhaahdaa, Markii aad sare uga qaaddaan
inta ugu wanaagsan, waxaa reer Laawi loogu tirinayaa sida
hadhuudhka meesha wax lagu tumo yaal iyo sida midhaha
canabka oo macsaradda yaal. 31 Oo meel kastaad ku
cuni doontaan idinka iyo reerihiinnuba, waayo, iyadu waa
abaalgudkiinna aad ka heshaan hawsha aad ka qabataan
teendhada shirka. 32 Oo idinku taas aawadeed dembi
u qaadi maysaan, markaad sare uga qaaddaan inteeda
ugu wanaagsan; oo waa inaydaan nijaasayn waxyaalaha
quduuska ah oo reer binu Israa'iil.

19 Markaasaa Rabbigu Muuse iyo Haaruun la hadlay
oo wuxuu ku yidhi, 2 Kanu waa qaynuunkii sharciga
Rabbigu idinku amray oo uu idinku yidhi, Reer binu Israa'iil
la hadla, oo waxaad ku tidhaahdaan, Noo keena qaalin
lo'aad oo cas oo aan bar iyo iin lahayn oo aan weligeed
harqood la saarin. 3 Oo waxaad iyada siisaan wadaadka
Elecaasaar ah, oo isagu iyada ha geeyo xerada dibaddeeda,
oo hortiisa waa in lagu gowracaa. 4 Oo markaas wadaadka
Elecaasaar ahu waa inuu dhiiggeeda farta ku qaadaa, oo
uu dhiiggeeda toddoba jeer ku rusheeya xagga teendhada
shirka horteeda. 5 Oo waa in qaalinta hortiisa lagu gubaa.
Haraggeeda, iyo hilibkeeda, iyo dhiiggeeda, iyo uuskeedaba
waa in la wada gubaa. 6 Oo markaas waa in wadaadku
soo qaadaa qoryo ah geed kedar la yidhaahdo, iyo husob,
iyo wax guduud ah, oo waa inuu ku dhex tuuro dabka
qaalintu ku gubanayso. 7 Oo markaas wadaadku dharkiisa
ha maydho, oo jidhkiisana biyo ha ku maydho, oo markaas
ka dib xerada ha soo galo, oo tan iyo fiidkii wadaadku nijaas
buu ahaan doonaa. 8 Oo kii qaalinta gubona dharkiisa biyo
ha ku maydho, jidhkiisana biyo ha ku maydho, oo isna
tan iyo fiidkii nijaas buu ahaan doonaa. 9 Oo markaas
nin daahir ahu ha soo ururiyo qaalinta dambaskeedii, oo
meel xerada dibaddeeda oo nadiif ah ha dhigo, oo shirka
reer binu Israa'iil ha lagu dhigo biyaha nijaasta daahiriya;
waayo, iyadu waa dembi qurbaankiis. 10 Oo kii dambaska
qaalinta soo ururiyaana dharkiisa ha maydho, oo tan iyo
fiidkiina nijaas buu ahaan doonaa, oo taasu waa inay
reer binu Israa'iil iyo shisheeyaha la degganba u ahaataa
qaynuun weligiis jira. 11 Oo kii qof meyd ah taabta intii
toddoba maalmood ah ayuu nijaas ahaan doonaa. 12
Oo kaasu waa inuu maalinta saddexaad isku daahiriyaa,
oo maalinta toddobaad isagu daahir buu ahaan doonaa;
laakiinse haddaanu maalinta saddexaad isdaahirin, markaas
maalinta toddobaad daahir ma uu ahaan doono. 13 Oo ku
alla kii qof dhintay meydkiis taabta oo aan isdaahirin, kaasu
wuxuu nijaaseeyaa Rabbiga taambuuggiisa, oo qofkaasu
wuu ka go'i doonaa reer binu Israa'iil, maxaa yeelay, isaga
laguma rushayn biyaha nijaasta daahiriya, oo isagu nijaas
buu ahaan doonaa, oo nijaasnimadiisa ayaa weli saaran. 14
Oo tanu waa sharciga markii nin teendho ku dhex dhinto. Mid
kasta oo teendhada soo gala, iyo mid kasta oo teendhada
ku jirayba, intii toddoba maalmood ah ayay nijaas ahaan
doonaan. 15 Oo weel kasta oo furan oo aan lahayn dabool

ku xidhan waa nijaas. 16 Oo ku alla kii berrin bannaan ku
soo taabta qof seef lagu dilay, ama meyd, ama laf dad, ama
qabri, intii toddoba maalmood ah ayuu nijaas ahaan doonaa.
17 Oo nijaasta aawadeed waa in loo qaadaa dambaska
qurbaankii dembiga oo la gubay, oo biyo socda waa in weel
lagula shubaa, 18 oo markaas waa in qof daahir ahu geed
husob ah soo qaadaa, oo uu biyaha daraa, oo kolkaas ha
ku rusheeyo teendhada, iyo weelasha oo dhan, iyo dadkii
halkaas joogay, iyo kii taabtay lafta, ama qofka la dilay, ama
meydka, ama qabriga. 19 Oo qofka daahirka ahu waa inuu
maalinta saddexaad iyo maalinta toddobaad ku rusheeyaa kii
nijaas ah, oo maalinta toddobaad waa inuu isaga daahiriyaa,
markaas dharkiisana ha maydho, jidhkiisana biyo ha ku
maydho, oo markaas fiidkii daahir buu ahaan doonaa. 20
Laakiinse qofka nijaasta ah, oo aan isdaahirin, qofkaasu
shirka dhexdiisa waa in laga gooyaa, maxaa yeelay, wuxuu
nijaaseeyey Rabbiga meeshiisii quduuska ahayd, oo waa
nijaas oo laguma rushayn biyaha nijaasta daahiriya. 21
Kaasu wuxuu iyaga u ahaanayaa qaynuun weligiis jira, oo kii
rusheeyo biyaha nijaasta daahiriyana waa inuu dharkiisa
maydhaa, oo kii biyaha nijaasta daahiriya taabtaana nijaas
buu ahaan doonaa tan iyo fiidkii. 22 Oo wax alla wixii uu
qofka nijaasta ahu taabtana nijaas bay ahaan doonaan, oo
qofkii taabtaana tan iyo fiidkii nijaas buu ahaan doonaa.

**20** Oo reer binu Israa'iil, xataa shirkii oo dhammu waxay
cidladii Sin yimaadeen bishii kowaad. Markaasaa
dadkii waxay degeen Qaadeesh, oo Maryanna halkaasay
ku dhimatay, oo halkaasaa lagu aasay. 2 Oo shirkiina biyo
ma haysan, oo markaasay Muuse iyo Haaruun u wada
shireen. 3 Kolkaasaa dadkii Muuse la dirireen, wayna la
hadleen oo ku yidhaahdeen, Waxaa noo roonayd inaannu
walaalahayo iskala dhimanno markay Rabbiga hortiisa ku
dhinteen! 4 Bal maxaad shirka Rabbiga cidladan u keenteen
si aan annaga iyo lo'dayaduba halkan ugu wada dhimanno?
5 Oo maxaadse dalkii Masar nooga soo bixiseen, oo aad
meeshan sharka ah noo keenteen? Waayo, meeshanu ma
aha meel laga helo midho, ama berde, ama geedcanab,
amase rummaanno; oo biyo la cabbona laguma arko. 6
Markaasay Muuse iyo Haaruun ururka hortiisii uga tageen
iriddii teendhadii shirka, kolkaasay wejiga dhulka dhigeen, oo
waxaa iyagii u muuqatay ammaantii Rabbiga. 7 Markaasaa
Rabbigu Muuse la hadlay, oo wuxuu ku yidhi, 8 Usha qaado,
oo adiga iyo walaalkaa Haaruun dadka shirka ah oo dhan
soo shiriya, oo iyagoo arkaya dhagaxa la hadla, biyo ha soo
daayee; oo waa inaad iyaga dhagaxa biyo uga keentaa, si
aad u wada waraabisid shirka iyo lo'doodaba. 9 Markaasaa
Muuse ushii ka qaatay Rabbiga hortiisa, siduu isaga ugu
amray. 10 Kolkaasay Muuse iyo Haaruun ururkii oo dhan ku
soo ururiyeen dhagaxa hortiisii, oo wuxuu iyagii ku yidhi,
War bal maqla, caasiyiin yahay. Dhagaxan biyo ma idiinka
soo daynaa? 11 Kolkaasaa Muuse gacanta kor u qaaday, oo
dhagaxii ayuu ushiisii laba jeer ku dhuftay; oo waxaa ka soo
baxay biyo aad u badan, oo shirkii iyo lo'doodiiba way wada
cabbeen. 12 Markaasaa Rabbigu Muuse iyo Haaruun ku
yidhi, Idinku ima aydaan rumaysan, oo quduusna igama
aydaan dhigin reer binu Israa'iil hortooda, haddaba sidaas
daraaddeed idinku shirkan geeyn maysaan dalkii aan iyaga
siiyey. 13 Kuwanu waa biyihii Meriibaah, maxaa yeelay,
reer binu Israa'iil way la dirireen Rabbiga, oo wuxuu iyaga
tusay inuu quduus yahay. 14 Markaasaa Muuse kuwa farriin
wada Qaadeesh uga diray boqorkii reer Edom, oo wuxuu ku
yidhi, Annagoo ah walaalahaa ilma Israa'iil waxaannu kugu
leennahay, Waad garanaysaa dhibkii nagu soo dhacay oo
dhan, 15 iyo sida awowayaashayo dalkii Masar u tageen, iyo
inaannu Masar wakhti dheer degganayn. Masriyiintu aad iyo
aad bay noo xumeeyeen annaga iyo awowayaashayoba.
16 Oo markaannu Rabbiga u qayshannay, codkayagii wuu
maqlay, oo wuxuu noo soo diray malaa'ig, oo Masarna
wuu naga soo bixiyey, oo haddana waxaannu joognaa
Qaadeesh oo ah magaalo ku taal soohdintaada darafkeeda.
17 Waan ku baryayaaye, na daa aan dalkaaga dhex marnee.
Kaa dhex mari mayno berrin ama beercanab, oo ceelasha
biyahoodana ka cabbi mayno. Waxaannu iska maraynaa
boqorka waddadiisa oo ugu leexan mayno xagga midigta
ama xagga bidixda jeeraannu soohdintaada ka baxno. 18
Markaasaa boqorkii Edom wuxuu ku yidhi, Dalkayga waa
inaanad soo dhex marin yaanan seef kuula soo bixine.
19 Markaasaa reer binu Israa'iil waxay ku yidhaahdeen,
Annagu waddada weyn baannu iska maraynaa, oo annaga
iyo lo'dayaduba haddaannu biyo kaa cabno qiimahooda
waannu ku siinaynaa, haddaba annagoo aan innaba wax
kale samayn aan dalkaaga cagaha ku dhex marno. 20
Oo isna wuxuu yidhi, Dalkayga soo dhex mari maysaan.
Markaasaa boqorkii Edom wuxuu u soo baxay reer binu
Israa'iil isagoo gacan xoog leh dad badan ku wata. 21 Oo
sidaasuu boqorkii Edom ugu diiday reer binu Israa'iil inay
soohdintiisa soo dhex maraan, oo saas aawadeed reer
binu Israa'iil isagii way ka leexdeen. 22 Oo Qaadeesh way
ka guureen, oo reer binu Israa'iil xataa shirkii oo dhammu
waxay yimaadeen Buur Xor. 23 Markaasaa Rabbigu Muuse
iyo Haaruun kula hadlay Buur Xor oo ku ag taal soohdinta
dalka Edom oo wuxuu ku yidhi, 24 Haaruun wuxuu ku
darman doonaa dadkiisii, waayo, isagu geli maayo dalkii aan

siiyey reer binu Israa'iil, maxaa yeelay, hadalkaygii waad
ku caasideen markaad biyihii Meriibaah ag joogteen. 25
Haddaba Haaruun iyo wiilkiisa Elecaasaar soo wad, oo
waxaad iyaga keentaa Buur Xor. 26 Oo markaas Haaruun
dharkiisa ka bixi oo waxaad u gelisaa wiilkiisa Elecaasaar,
oo Haaruun dadkiisa wuu ku darman doonaa, oo halkaasuu
ku dhiman doonaa. 27 Markaasaa Muuse sameeyey sidii
Rabbigu ku amray, oo waxay fuuleen Buur Xor iyadoo shirkii
oo dhammu ay u jeedaan. 28 Markaasaa Muuse Haaruun ka
bixiyey dharkiisii, oo wuxuu u geliyey wiilkiisii Elecaasaar,
markaasaa Haaruun ku dhintay halkaas oo ahaa buurtii
dhaladeeda; kolkaasay Muuse iyo Elecaasaar buurtii ka
soo degeen. 29 Oo markii shirkii oo dhammu ay arkeen in
Haaruun dhintay ayaa reer binu Israa'iil oo dhammu waxay
Haaruun u ooyeen intii soddon maalmood ah.

21 Oo boqorkii Caraad, oo reer Kancaan, oo xagga
koonfureed degganaa ayaa maqlay in reer binu Israa'iil
ka yimaadeen xagga jidka Ataariim, markaasuu la diriray
reer binu Israa'iil oo qaarkood qabsaday. 2 Markaasay reer
binu Israa'iil Rabbiga nidar u nidreen oo waxay yidhaahdeen,
Hubaal haddaad dadkan gacantayada soo gelisid markaas
magaalooyinkooda oo dhan waannu wada baabbi'inaynaa.
3 Oo Rabbigu wuu dhegaystay codkii reer binu Israa'iil,
oo gacantooda buu soo geliyey reer Kancaan, oo iyana
iyagii iyo magaalooyinkoodiiba way wada baabbi'iyeen, oo
meeshaas magaceediina waxaa loo bixiyey Xormaah. 4 Oo
Buur Xor waxay uga guureen xagga jidka loo maro Badda
Cas inay hareer ka maraan dalka reer Edom. Markaasay
dadku aad u qalbi jabeen jidkii daraaddiis. 5 Oo dadkii
waxay ku hadleen wax ka gees ah Ilaah iyo Muuseba,
oo waxay yidhaahdeen, War dalkii Masar maxaad nooga
soo bixiseen si aannu cidladan ugu dhimanno? Waayo,
kibis ma jirto, biyona ma jiraan, oo naftayaduna kibistan
khafiifka ah way ku yaqyaqsataa. 6 Markaasaa Rabbigu
wuxuu dadka dhexdiisii ku soo daayay abeesooyin qaniinyo
kulul oo ay dadkii qanqaniineen, oo dad badan oo reer
binu Israa'iil ah ayaa dhintay. 7 Markaasay dadkii Muuse u
yimaadeen, oo waxay ku yidhaahdeen, Annagu waannu
dembaabnay, maxaa yeelay, waxaannu ku hadalnay wax
ka gees ah Rabbiga iyo adiga, haddaba Rabbiga noo bari
inuu abeesooyinka naga fogeeyo. Markaasaa Muuse dadkii
u baryay Rabbiga. 8 Oo Rabbigu wuxuu Muuse ku yidhi,
Abeeso samee, oo tiircalan kor saar, oo mid kasta oo la
qaniinoba, markuu arko wuu noolaanayaa. 9 Oo Muuse baa
abeeso naxaas ah sameeyey oo wuxuu kor saaray tiirkii
calanka, oo haddii abeeso qof qaniinto oo qofku soo eego
abeesadii naxaasta ahayd wuu noolaan jiray. 10 Markaasaa
reer binu Israa'iil soo guureen, oo waxay degeen Obod.
11 Oo Obodna way ka guureen, oo waxay degeen Ciyee
Hacabaariim oo cidlada ku dhex taal oo ah Moo'aab horteeda
oo xagga qorrax ka soo baxa ah. 12 Oo halkaasna way ka
guureen, oo waxay degeen dooxadii Sered, 13 Halkaasna
way ka guureen, oo waxay deggeen Webi Arnoon dhankiisa
kale, kaasoo cidlada ku yaal oo soohdinta reer Amor ka soo
baxa, waayo, Webi Arnoon waa soohdinta reer Moo'aab
oo wuxuu u dhexeeyaa reer Moo'aab iyo reer Amor. 14
Haddaba kitaabkii dagaalladii Rabbiga waxaa ku qoran,
Waaheeb oo Suufaah ku taal, Iyo dooxooyinka Arnoon,
15 Iyo dhaadhaca dooxooyinka Oo u dadban xagga rugta
Caar, Oo u dhow soohdinta reer Moo'aab. 16 Oo halkaasna
waxay uga guureen xagga Bi'ir, kaasoo ah ceelkii Rabbigu
Muuse kaga yidhi, Dadka oo dhan soo ururi, oo anna biyo
waan siinayaa. 17 Markaasay reer binu Israa'iil gabaygan
ku gabyeen, Ceel yahow, soo durdur. War idinku u gabya
18 Ceelkii ay amiirradii qodeen, Oo ay dadkii gobta ahu ku
qodeen Ushii dowladnimada iyo ulahoodii. Oo cidladiina
waxay uga guureen xagga Mataanaah. 19 Oo Mataanaahna
waxay uga guureen xagga Naxalii'eel; Naxalii'eelna waxay
uga guureen xagga Baamood. 20 Oo Baamoodna waxay
uga guureen xagga dooxadii ku taal bannaanka Moo'aab,
iyo Buur Fisgaah dhaladeeda oo cidlada hoos u soo fiirisa.
21 Markaasay reer binu Israa'iil wargeeyayaal u direen Siixon
oo ahaa boqorkii reer Amor, oo waxay ku yidhaahdeen,
22 Na daa aan dalkaaga dhex marnee. Annagu gees ugu
leexan mayno berrin ama beercanab, oo ceelashana biyo ka
cabbi mayno. Waxaannu iska maraynaa boqorka waddadiisa
jeeraannu soohdintaada ka baxno. 23 Siixonse uma uu
oggolaan in reer binu Israa'iil soohdintiisa soo dhex maraan;
laakiinse Siixon dadkiisii oo dhan ayuu soo urursaday oo ku
soo baxay reer binu Israa'iil oo cidlada jooga, oo wuxuu
yimid Yahas, oo uu reer binu Israa'iil la diriray. 24 Markaasay
reer binu Israa'iil seef ku dileen, oo waxay qabsadeen
dalkiisii tan iyo Arnoon iyo ilaa Yabboq, iyo xataa tan iyo
reer Cammoon, waayo, soohdintii reer Cammoon wuu
xoog badnaa. 25 Oo reer binu Israa'iil magaalooyinkan oo
dhan ayay qabsadeen, oo reer binu Israa'iil waxay degeen
magaalooyinkii reer Amor oo dhan, xataa Xeshboon iyo
magaalooyinkeedii oo dhan. 26 Waayo, Xeshboon waxay
ahayd magaaladii Siixon oo ahaa boqorkii reer Amor, oo la
diriray boqorkii hore oo reer Moo'aab, oo dalkiisii oo dhan ka
qabsaday, xataa tan iyo Arnoon. 27 Oo sidaas daraaddeed
kuwa maahmaahyo ku hadlaa waxay yidhaahdaan, War
Xeshboon kaalaya, Magaaladii Siixon ha la dhiso oo ha

la xoojiyo, 28 Waayo, dab baa ka soo baxay Xeshboon,
Taasoo ah magaaladii Siixon oo olol ka soo baxay. Wuxuu
baabbi'iyey Caartii reer Moo'aab, Iyo sayidyadii meelaha sare
oo Arnoon. 29 Moo'aabay, waa kuu hoog! Waad baabba'day,
dadka reer Khemooshow. Wiilashiisii wuxuu u sii daayay
sida laajiyo, Gabdhihiisiina wuxuu maxaabiis ahaan ugu
sii daayay Boqorka reer Amor oo Siixon ahaa. 30 Iyaga
waannu toogannay; oo Xeshboon waa baabba'day tan iyo
Diibon, Oo annagu waxaannu baabbi'innay tan iyo Nofax,
Taasoo gaadha tan iyo Meedebaa. 31 Oo sidaasay reer binu
Israa'iil u degeen dalkii reer Amor. 32 Markaasaa Muuse
diray rag soo basaasa Yacser, oo iyana way qabsadeen
magaalooyinkeedii, oo reer Amorkii halkaas degganaana
way ka eryeen. 33 Oo intay leexdeen ayay waxay tageen
xagga jidka Baashaan loo maro. Markaasaa waxaa ku soo
baxay Coog oo ahaa boqorkii Baashaan, isagii iyo dadkiisii
oo dhanba, inay kula diriraan Edrecii. 34 Markaasaa Rabbigu
Muuse ku yidhi, Ha ka cabsan, waayo, gacantaadaan geliyey
isaga iyo dadkiisa oo dhan iyo dalkiisa, oo waxaad isaga
ku samayn doontaa sidii aad ku samaysay Siixon oo ahaa
boqorkii reer Amor oo Xeshboon degganaa. 35 Oo iyana
waxay dileen isagii, iyo wiilashiisii, iyo dadkiisii oo dhan ilaa
ayan isagii waxba u hadhin, oo dalkiisiina way qabsadeen.

**22** Markaasaa reer binu Israa'iil guureen, oo waxay degeen
bannaanka Moo'aab oo Webi Urdun ka shisheeya oo
Yerixoo ka soo hor jeeda. 2 Oo Baalaaq ina Sifoor wuxuu
arkay kulli wixii ay reer binu Israa'iil ku sameeyeen reer
Amor. 3 Oo reer Moo'aab dadka bay ka cabsadeen, maxaa
yeelay, iyagu aad bay u badnaayeen, oo reer Moo'aab aad
iyo aad bay u welweleen reer binu Israa'iil aawadood. 4
Markaasaa reer Moo'aab waxay ku yidhaahdeen odayaashii
reer Midyaan, Sida dibi u dhammaysto cawska berrinka ayaa
dadkan faraha badanu waxa hareerahayaga ku wareegsan
oo dhan u dhammaysanayaan. Oo wakhtigaas waxaa
reer Moo'aab boqor u ahaa Baalaaq ina Sifoor. 5 Oo
wargeeyayaal buu u diray Balcaam ina Becoor oo joogay
Fetoor oo Webiga ku ag taal oo ah dalkii dadkiisa si ay ugu
yeedhaan oo wuxuu ku yidhi, Bal eeg, halkan waxaa jooga
dad Masar ka yimid, oo dhulkii oo dhan way qarinayaan,
oo waxay deggan yihiin hortayda. 6 Haddaba waan ku
baryayaaye kaalay oo dadkan ii habaar, waayo, way iga xoog
badan yihiin, oo mindhaa waan ka adkaanayaa si aannu ugu
layno, oo dalka uga erinno, waayo, waan ogahay in kii aad u
ducaysaa wuu ducaysan yahay, kii aad habaartaana wuu
habaaran yahay. 7 Markaasaa odayaashii reer Moo'aab iyo
odayaashii reer Midyaan waxay gacantooda ku qaadeen
abaalgudkii habaaridda, oo waxay u tageen Balcaam, oo
isagay kula hadleen erayadii Baalaaq. 8 Oo isna wuxuu ku
yidhi iyagii, Caawa halkan ku barya oo anna war dambaan
idiinka keenayaa wixii Rabbigu igula hadlo. Markaasay
amiirradii reer Moo'aab la hoydeen Balcaam. 9 Markaasaa
Ilaah Balcaam u yimid, oo wuxuu ku yidhi, War nimanka
kula joogaa yay yihiin? 10 Markaasaa Balcaam wuxuu Ilaah
ku yidhi, Baalaaq ina Sifoor oo ah boqorkii reer Moo'aab
ayaa ii soo diray oo yidhi, 11 Bal eeg, dadka Masar ka yimid
waxay qarinayaan dhulka oo dhan, haddaba kaalay oo ii
habaar, oo mindhaa waan karayaa inaan iyaga la diriro oo
aan eryado. 12 Markaasaa Rabbigu wuxuu Balcaam ku
yidhi, Waa inaanad iyaga raacin, oo waa inaanad dadka
habaarin, waayo, iyagu waa barakaysan yihiin. 13 Aroortii
dambe ayaa Balcaam kacay, oo wuxuu amiirradii Baalaaq
ku yidhi, Dalkiinnii taga, waayo, Rabbigu fasax buu ii diidaa
inaan idin raaco. 14 Markaasaa amiirradii reer Moo'aab
kaceen, oo Baalaaq u tageen, oo waxay ku yidhaahdeen,
Balcaam waa diiday inuu na soo raaco. 15 Oo Baalaaq
haddana wuxuu diray amiirro kale oo kuwii hore ka sii
badan oo ka sii derejo weyn. 16 Oo iyana Balcaam bay
u tageen, oo waxay ku yidhaahdeen, Baalaaq ina Sifoor
wuxuu kugu leeyahay, Waan ku baryayaaye inaad ii timaado
yaanay waxba kaa hor joogsan. 17 Waxaan ku siinayaa
derejo sharaf ah, oo wax alla wixii aad igu tidhaahdona
waan samaynayaa. Haddaba waan ku baryayaaye kaalay
oo dadkan ii habaar. 18 Markaasaa Balcaam jawaabay, oo
wuxuu addoommadii Baalaaq ku yidhi, Haddii Baalaaq i
siiyo gurigiisa oo lacag iyo dahab ka buuxo, anigu kama
tallaabsan karo erayga Rabbiga Ilaahayga ah inaan sameeyo
wax ka yar iyo wax ka badan toona. 19 Haddaba waan
idin baryayaaye, Bal caawa halkan isaga hoyda, bal aan
soo ogaado waxa kaloo Rabbigu igula hadlee. 20 Oo
habeennimadii ayaa Ilaah Balcaam u yimid, oo wuxuu ku
yidhi, Haddii nimanku u yimaadeen inay kuu yeedhaan, kac
oo iyaga raac; laakiinse waxaad yeeshaa aan kugula hadlo
oo keliya. 21 Oo subaxdii dambe ayaa Balcaam kacay oo
dameertiisii kooraystay, kolkaasuu raacay amiirradii reer
Moo'aab. 22 Oo Ilaah cadhadiisiina way kululaatay, maxaa
yeelay, Balcaam baa tegey. Markaasaa malaa'igtii Rabbigu
jidka istaagtay iyadoo cadow ku ah isaga. Haddaba isagu
wuxuu iska fuushanaa dameertiisii, oo labadiisii addoonna
way la socdeen. 23 Markaasaa dameertii waxay aragtay
malaa'igtii Rabbiga oo jidka taagan oo seefteedii oo galka ka
baxsan gacanta ku haysata. Kolkaasay dameertii jidka ka
leexatay oo berrinka gashay. Oo Balcaamna dameertii wax
buu ku dhuftay si uu jidka ugu soo celiyo. 24 Markaasaa
malaa'igtii Rabbigu waxay istaagtay surun beercanabyada

ku dhex yaal oo dhankan deyr ka yahay, dhanka kalena
deyr ka yahay. 25 Oo haddana dameertii waxay aragtay
malaa'igtii Rabbiga, markaasay derbiga isku jiidday, oo
Balcaam cagtiisii ayay derbigii kula qabatay, oo isna haddana
wax buu ku dhuftay. 26 Markaasaa malaa'igtii Rabbigu
hore u sii socotay oo waxay istaagtay meel cidhiidhi ah oo
aan meel looga leexdo lahayn midig iyo bidix toona. 27
Oo haddana dameertii waxay aragtay malaa'igtii Rabbiga,
markaasay iska jiifsatay Balcaam hoostiisa, Balcaamna wuu
cadhooday, oo dameertii usha ku dhuftay. 28 Markaasaa
Rabbigu afka dameerta furay oo waxay Balcaam ku tidhi,
War maxaan kugu sameeyey oo aad saddexdan jeer ii
dishay? 29 Markaasaa Balcaam dameertii ku yidhi, Maxaa
yeelay, adigu waad igu majaajilootay. Oo weliba waxaan
jeclaan lahaa in seefu gacantayda ku jirto, waayo, waan
ku dili lahaa hadda. 30 Markaasaa dameertii Balcaam ku
tidhi, War sow ma ahi dameertaadii aad cimrigaaga oo dhan
fuuli jirtay ilaa maantadan? Oo miyaan hore sidan oo kale
weligay kugu sameeyey? Oo isna wuxuu ku yidhi, Maya.
31 Kolkaasaa Rabbigu Balcaam indhaha u furay oo wuxuu
arkay malaa'igtii Rabbiga oo jidka dhex taagan oo seefteedii
oo galka ka baxsan gacanta ku haysata. Markaasuu madaxa
foororiyey oo sujuuday. 32 Kolkaasaa malaa'igtii Rabbigu
waxay isagii ku tidhi, War maxaad dameertaada u dishay
saddexdan jeer? Bal eeg, anigu waxaan u soo baxay cadow
ahaan, maxaa yeelay, jidkaagu hortayda waa ku qalloocan
yahay. 33 Oo dameertuna anay i aragtay oo saddexdan
jeerba hortayday ka leexatay. Oo haddaanay iga leexan,
hubaal waan ku dili lahaa, iyadase waan badbaadin lahaa.
34 Oo Balcaam wuxuu malaa'igtii Rabbiga ku yidhi, Waan
dembaabay, waayo, ma aan ogayn inaad jidka taagan tahay
adigoo iga gees ah. Haddaba haddii sidaasu ku xumayso,
dib baan u noqonayaa. 35 Markaasaa malaa'igtii Rabbigu
Balcaam ku tidhi, Orod oo nimanka raac; laakiinse hadalkii
aan kula hadlo oo keliya waa inaad ku hadashaa. Sidaas
daraaddeed Balcaam wuxuu raacay amiirradii Baalaaq soo
diray. 36 Oo Baalaaq markuu maqlay in Balcaam yimid
ayuu u baxay inuu isaga ku qaabbilo magaaladii Moo'aab
oo ku taal soohdinta Arnoon oo ah soohdinta darafkeeda.
37 Markaasaa Baalaaq wuxuu Balcaam ku yidhi, War sow
degdeg dad kuuguma soo dirin inay kuu yeedhaan? Maxaad
iigu iman weyday? Miyaanan awoodin inaan derejo weyn
ku siiyo? 38 Kolkaasaa Balcaam wuxuu Baalaaq ku yidhi,
Haddaba waa i kan oo waan kuu imid. War anigu ma waxaan
leeyahay awood aan wax kaga hadlo innaba ha ahaatee?
Ereygii Ilaah afkayga geliyo ayaan ku hadli doonaa. 39
Markaasaa Balcaam raacay Baalaaq, oo waxay yimaadeen
Qiryad Xusood. 40 Markaasaa Baalaaq allabari u bixiyey dibi
iyo ido, oo wax buu u diray Balcaam iyo amiirradii isaga
la joogay. 41 Oo subaxdii dambe ayaa Baalaaq kaxaystay
Balcaam, oo wuxuu keenay meelihii sare oo Bacal, oo
halkaas wuxuu ka arkay dadka darafkii ugu shisheeya.

**23** Oo Balcaam wuxuu Baalaaq ku yidhi, Halkan iiga
dhis toddoba meelood oo allabari, oo halkan iigu soo
diyaari toddoba dibi iyo toddoba wan. 2 Markaasaa Baalaaq
sameeyey sidii Balcaam ku hadlay, oo Baalaaq iyo Balcaam
meel kasta oo allabariba waxay ku dul bixiyeen dibi iyo wan.
3 Kolkaasaa Balcaam Baalaaq ku yidhi, Allabarigaaga la
gubo ah istaag, oo anna waan tegayaa, mindhaa Rabbigu
waa iga hor iman doonaa, oo wax alla wixii uu i tuso waan
kuu sheegi doonaa. Markaasuu meel sare oo bannaan
tegey. 4 Kolkaasaa Ilaah Balcaam ka hor yimid, oo wuxuu
ku yidhi, Waxaan diyaariyey toddobada meelood oo allabari,
oo meel kastaba waxaan ku dul bixiyey dibi iyo wan. 5
Markaasaa Rabbigu eray Balcaam afka u geliyey, oo wuxuu
ku yidhi, Baalaaq ku noqo oo sidatan ula hadal. 6 Oo isna
markaasuu ku noqday, oo wuxuu arkay isagoo ag taagan
allabarigiisii la gubo, isagii iyo amiirradii reer Moo'aab oo
dhan. 7 Markaasuu hadalkiisii bilaabay oo wuxuu yidhi,
Baalaaq oo ah boqorkii reer Moo'aab oo ka yimid xagga
buuraha bariga Ayaa iga keenay Araam, oo yidhi, Kaalay,
oo reer Yacquub ii habaar, Oo kaalay, cadhadaadu reer
binu Israa'iil ha ku dhacdo. 8 Bal sidee baan u habaaraa
mid aan Ilaah habaarin? Oo sidee baan ugu cadhoodaa
mid aan Rabbigu ka cadhaysnayn? 9 Waayo, dhagaxyada
dushooda ayaan ka arkaa, Oo xagga buuraha ayaan uga
jeedaa, Oo bal eeg, waa dad gooni u deggan, Iyagana
quruumaha kale laguma tirin doono. 10 Bal yaa qiyaasi kara
reer Yacquub oo sida boodhka ah? Amase yaa tirin kara
reer binu Israa'iil rubuciis? Anigu aan u dhinto sida kuwa
xaqa ahu u dhintaan, Oo ugu dambaystayduna ha ahaato
sida tooda oo kale. 11 Kolkaasaa Baalaaq wuxuu Balcaam
ku yidhi, War waa maxay waxa aad igu samaysay? Waxaan
ku soo watay inaad cadaawayaashayda habaartid, laakiinse
bal eeg, waad u wada ducaysay. 12 Kolkaasuu u jawaabay
oo wuxuu ku yidhi, Sow waajib iguma aha inaan isjiro si
aan ugu hadlo wixii Rabbigu afkayga geliyo? 13 Markaasaa
Baalaaq isagii ku yidhi, Waan ku baryayaaye, Kaalay, oo
meel kale ii raac inaad halkaas iyaga ka aragtid. Waxaad arki
doontaa darafkooda, oo kulligood ma arki doontid; haddaba
halkaas iiga habaar. 14 Markaasuu isagii geeyey berrinkii
Sofiim xagga Buur Fisgaah dhaladeeda, oo halkaasuu ka
dhisay toddoba meelood oo allabari, oo meel kasta wuxuu

ku dul bixiyey dibi iyo wan. 15 Oo markaasuu Baalaaq ku yidhi, Halkan allabarigaaga la gubo ag istaag intaan Rabbiga xaggaas shishe kaga hor tegayo. 16 Markaasaa Rabbigu ka hor yimid Balcaam, oo eray buu afka u geliyey, oo wuxuu ku yidhi, Baalaaq ku noqo, oo sidatan ula hadal. 17 Markaasuu isagii u yimid, oo wuxuu arkay isagoo ag taagan allabarigiisii la gubo, oo waxaa isaga la jiray amiirradii reer Moo'aab. Kolkaasaa Baalaaq isagii ku yidhi, War Rabbigu muxuu ku hadlay? 18 Markaasuu hadalkiisii sii watay, oo wuxuu yidhi, Baalaaq, kac oo maqal, Bal aniga i dhegayso, ina Sifoorow. 19 Ilaah ma aha nin been sheego; Mana aha binu-aadmi qoomameeyo. Ma wuxuu yidhi buusan samaynayn? Ama ma wuxuu ku hadlay buusan yeelayn? 20 Bal eeg, waxaa laygu amray inaan u duceeyo. Isagaa barakeeyey, anna barakadaas ma aan beddeli karo. 21 Isagu reer Yacquub dembi kuma uu arag, Oo reer binu Israa'iil qalloocsanaan ugama uu jeedin. Rabbiga Ilaahood ah ayaa iyaga la jira, Oo waxaa dhexdooda ka yeedhaysa boqor qayladiis. 22 Ilaah baa iyaga Masar ka soo bixiyey, Iyagu waxay leeyihiin xoog gisiyeed oo kale, 23 Hubaal sixir reer Yacquub kuma dhaco, Oo reer binu Israa'iil innaba fal ma qabto, Haddaba Yacquub iyo Israa'iil waxaa laga sheegi doonaa, Bal fiiri waxa Ilaah sameeyey! 24 Bal eeg, dadku wuxuu u kacaa sidii gool oo kale, Oo sidii aar oo kale ayuu isu qaadaa: Oo isagu jiifsan maayo jeeruu ugaadh cuno, Oo uu dhiigga ka cabbo waxa uu dishay. 25 Markaasaa Baalaaq wuxuu Balcaam ku yidhi, War iyaga hana habaarin, hana u ducayn innaba. 26 Laakiinse Balcaam ayaa jawaabay oo wuxuu Baalaaq ku yidhi, Sow kuuma sheegin oo kuguma odhan, Wixii Rabbigu ku hadlo oo dhan waa inaan sameeyaa? 27 Markaasaa Baalaaq wuxuu Balcaam ku yidhi, Haddaba kaalay, meel kalaan ku geeynayaaye, mindhaa Ilaah waa ku farxi doonaa inaad iyaga halkaas iiga habaartid. 28 Markaasaa Baalaaq wuxuu Balcaam geeyey Buur Fecoor dhaladeeda taasoo lamadegaanka hoos u soo fiirisa. 29 Oo Balcaam wuxuu Baalaaq ku yidhi, Halkan iiga dhis toddoba meelood oo allabari, oo halkan iigu soo diyaari toddoba dibi iyo toddoba wan. 30 Markaasaa Baalaaq sameeyey sidii Balcaam ku yidhi, oo meel kasta oo allabariba wuxuu ku dul bixiyey dibi iyo wan.

**24** Oo Balcaamna markuu arkay in Rabbigu ku farxay inuu reer binu Israa'iil barakeeyo, ma uu tegin sidii mararkii kale inuu sixir doondoono, laakiinse wuxuu wejigiisii u jeediyey xagga cidlada. 2 Markaasaa Balcaam indhaha kor u qaaday, oo wuxuu arkay reer binu Israa'iil oo qabiil qabiil u deggan, kolkaasaa waxaa isagii ku soo degay ruuxii Ilaah. 3 Markaasuu hadalkiisii watay oo wuxuu yidhi, Balcaam ina Becoor wuxuu leeyahay, Oo ninkii ishiisu daboolnaan jirtay wuxuu leeyahay, 4 Wuxuu leeyahay kii erayadii Ilaah maqla Oo tusniintii Ilaaha Qaadirka ah arka, Oo dhaca isagoo indhihiisu furan yihiin, 5 Teendhooyinkiinnu wanaagsanaa, Reer Yacquubow, Oo taambuugyadiinnu qurxoonaa, Reer binu Israa'iilow! 6 Waxay u fidsan yihiin sidii dooxooyin, Iyo sidii beero webiga barbarkiisa ku yaal, Iyo sidii geedo dacar ah oo Rabbigu beeray, Iyo sidii geedo kedar ah oo biyo ku ag yaal. 7 Baaldiyadooda waxaa ka daadan doona biyo, Oo farcankoodu wuxuu ku jiri doonaa biyo badan, Oo boqorkooduna wuu ka sarrayn doonaa Agag, Oo boqortooyadoodana waa la sarraysiin doonaa. 8 Ilaah baa iyaga Masar ka soo bixiyey, Oo iyagu waxay leeyihiin xoog gisiyeed oo kale, Oo waxay cuni doonaan quruumaha cadaawayaashooda ah, Oo lafahooda way jejebin doonaan, Oo waxay iyaga ka mudhbixin doonaan fallaadhahooda. 9 Iyagu hoos bay isu gaabiyeen, oo sida aar bay u jiifsadeen, Iyo sida gool libaax; haddaba bal yaa kicin doona? Duco ha ku dhacdo ku alla kii idiin duceeya, Oo habaarna ha ku dhaco ku alla kii idin habaara. 10 Markaasaa Baalaaq aad ugu cadhooday Balcaam, oo gacmihiisuu isku dhuftay. Oo Baalaaq wuxuu Balcaam ku yidhi, Waxaan kuugu yeedhay inaad cadaawayaashayda ii habaartid, oo bal eeg, saddexdan jeer baad u wada ducaysay. 11 Haddaba meeshaadii ku carar. Anigu waxaan damacsanaa inaan derejo weyn ku siiyo, laakiinse Rabbigu dib buu kaaga celiyey derejadii. 12 Kolkaasaa Balcaam wuxuu Baalaaq ku yidhi, War kuwii farriin kaa waday miyaanan u sheegin oo aanan ku odhan, 13 Haddii Baalaaq i siiyo gurigiisa oo lacag iyo dahab ka buuxo, anigu kama tallaabsan karo erayga Rabbiga inaan maankayga ka sameeyo xumaan iyo samaan toona. Wixii Rabbigu ku hadlo, kaas uun baan ku hadli doonaa. 14 Haddaba waxaan u tegayaa dadkaygii, oo bal kaalay aan kuu sheego waxay dadkanu dadkaaga ku samayn doonaan maalmaha ugu dambaysta. 15 Markaasuu hadalkiisii sii watay oo wuxuu yidhi, Balcaam ina Becoor wuxuu leeyahay, Oo ninkii ishiisu daboolnaan jirtay wuxuu leeyahay, 16 Wuxuu leeyahay kii erayadii Ilaah maqla, Oo yaqaan aqoonta Kan ugu sarreeya, Oo tusniintii Ilaaha Qaadirka ah arka, Oo dhaca, isagoo indhihiisu furan yihiin, 17 Isagaan arkaa, haddase ma aha, Waan u jeedaa, mase dhowa, Reer Yacquub xiddig baa ka soo bixi doonta, Reer binu Israa'iil waxaa ka soo kici doonta ul boqortooyo, Oo waxay burburin doontaa rukummada Moo'aab, Oo waxay baabbi'in doontaa dadka Sheed oo dhan. 18 Oo dalka Edom wuxuu noqonayaa hantidooda, Oo Seciir oo isna

cadowgooda ahaa hantidooduu noqonayaa. Oo reer binu
Israa'iil way xoogaysan doonaan. 19 Oo mid reer Yacquub ka
soo farcamay ayaa xukun yeelan doona, Oo wuxuu baabbi'in
doonaa kuwa magaalada ka hadha. 20 Markaasuu Camaaleq
eegay, oo hadalkiisii sii watay oo yidhi, Camaaleq wuxuu
ahaa kan quruumaha ugu horreeya, Laakiinse ugudambaysta
wuu halligmi doonaa. 21 Oo haddana wuxuu eegay reer
Qeyn, markaasuu hadalkiisii sii watay oo yidhi, Meeshaad
deggan tihiin waa adag tahay, Oo buulkiinnana dhagaxaa
laga dhisay. 22 Habase yeeshee waa laydin baabbi'in
doonaa, reer Qeynow, Jeer ay reer Ashuur maxaabiis ahaan
idiin kaxaystaan. 23 Markaasuu hadalkiisii sii watay oo wuxuu
yidhi, Hoogay, ee bal yaa sii noolaan doona markii Ilaah
waxan sameeyo? 24 Laakiinse doonniyo waxay ka iman
doonaan xeebta Kitiim, Oo waxay dhibi doonaan Ashuur, oo
waxay dhibi doonaan Ceeber, Oo isna wuu halligmi doonaa.
25 Markaasaa Balcaam kacay oo ku noqday meeshiisii;
Baalaaqna wuu iska tegey.

**25** Oo reer binu Israa'iilna waxay iska degeen Shitiim,
markaasay dadkii bilaabeen inay ka dhillaystaan
gabdhihii reer Moo'aab, 2 waayo, dadkii bay ugu yeedheen
allabaryadii ilaahyadooda, markaasay dadkii wax cuneen, oo
waxay u sujuudeen ilaahyadoodii. 3 Oo reer binu Israa'iil
waxay isku dareen Bacal Fecoor. Markaasaa Rabbiga
cadhadiisii aad ugu kululaatay reer binu Israa'iil. 4 Kolkaasaa
Rabbigu Muuse ku yidhi, Dadka madaxdiisa oo dhan soo
wado oo maalin cad ku deldel Rabbiga hortiisa in cadhadii
kululayd oo Rabbigu ay ka soo noqoto reer binu Israa'iil. 5
Kolkaasaa Muuse wuxuu xaakinnadii reer binu Israa'iil ku
yidhi, Idinka mid waluba ha dilo nimankiisii Bacal Fecoor isku
daray. 6 Oo bal eeg, mid reer binu Israa'iil ah ayaa walaalihiis
ula yimid naag reer Midyaan ah Muuse hortiisa iyo shirkii
reer binu Israa'iil oo dhan hortooda iyagoo ku ooyaya iriddii
teendhadii shirka horteeda. 7 Oo Fiinexaas ina Elecaasaar
oo ahaa wadaadkii Haaruun wiilkiisii markuu taas arkay
ayuu shirka dhexdiisii ka kacay oo wuxuu gacanta ku qaatay
waran. 8 Oo teendhadii ayuu uga daba galay ninkii reer
binu Israa'iil, oo ninkii reer binu Israa'iil iyo naagtii labadiiba
calooshuu ka wareemay. Markaasaa belaayadii laga joojiyey
reer binu Israa'iil. 9 Oo intii belaayadii u dhimatay waxay
ahaayeen afar iyo labaatan kun. 10 Kolkaasaa Rabbigu
Muuse la hadlay, oo wuxuu ku yidhi, 11 Waxaa cadhadaydii
reer binu Israa'iil ka celiyey Fiinexaas ina Elecaasaar oo
ah wiilkii wadaadka Haaruun ah, waayo, dhexdooda ayuu
iiga qiirooday, oo sidaas daraaddeed anigu qiiradaydii
kuma aan baabbi'in reer binu Israa'iil. 12 Haddaba sidaas
daraaddeed waxaad tidhaahdaa, Bal eeg, anigu waxaan
isaga la dhiganayaa axdigaygii nabadda. 13 Oo isaga iyo
farcankiisa ka dambeeyaba buu u ahaan doonaa axdiga
wadaadnimo weligeed ah, maxaa yeelay, Ilaahiis buu qiiro
u qabay, oo reer binu Israa'iil ayuu u kafaaro guday. 14
Haddaba ninkii reer binu Israa'iil oo la dilay, oo naagtii reer
Midyaan lala dilay, magiciisu wuxuu ahaa Simrii ina Saaluu
oo amiir u ahaa qoladiisa reer Simecoon. 15 Oo naagtii
reer Midyaan oo la dilay magaceedu wuxuu ahaa Kaasbii
ina Suur, oo aabbeheed wuxuu madax u ahaa qolo ka mid
ah reer Midyaan. 16 Markaasaa Rabbigu Muuse la hadlay
oo wuxuu ku yidhi, 17 Reer Midyaan dhib oo laa iyaga,
18 waayo, waxay idinku dhibeen khiyaanadooda ay idinku
khiyaaneeyeen xagga xaalkii Fecoor iyo xaalkii Kaasbii oo
ahayd gabadhii amiirka reer Midyaan oo walaashood ahayd,
taasoo maalintii belaayada la dilay xaalkii Fecoor aawadiis.

**26** Oo belaayadii dabadeed ayaa Rabbigu la hadlay
Muuse iyo Elecaasaar oo ahaa wadaadkii Haaruun
wiilkiisii, oo wuxuu ku yidhi, 2 Shirka reer binu Israa'iil oo dhan
u soo tiriya reer reer, intii labaatan sannadood jirta iyo intii
ka sii weyn, kuwaas oo ah inta reer binu Israa'iil ee dagaal
u bixi karta oo dhan. 3 Markaasaa Muuse iyo wadaadkii
Elecaasaar ahaa iyagii kula hadleen bannaankii Moo'aab oo
Webi Urdun ku ag yaal oo Yerixoo ka soo hor jeeda. 4 Oo
waxay ku yidhaahdeen, Dadka inta labaatan sannadood
jirta iyo inta ka sii weyn soo tiriya, sidii Rabbigu ku amray
Muuse iyo dadkii reer binu Israa'iil oo dalkii Masar ka soo
baxay. 5 Ruubeen wuxuu ahaa curadkii Israa'iil, oo waxaa
reer Ruubeen ka soo farcamay Xanoog oo dhalay qabiilka
reer Xanoog, iyo Falluu oo dhalay qabiilka reer Falluu, 6
iyo Xesroon oo dhalay qabiilkii reer Xesroon, iyo Karmii oo
dhalay qabiilkii reer Karmii. 7 Intaasu waa qabiilooyinkii reer
Ruubeen, oo intii iyaga laga tiriyey waxay ahaayeen saddex
iyo afartan kun iyo toddoba boqol iyo soddon. 8 Reer Falluu
waxaa ka dhashay Elii'aab. 9 Wiilashii Elii'aabna waxay
ahaayeen Nemuu'eel iyo Daataan iyo Abiiraam. Daataankan
iyo Abiiraamkanu waa kuwii shirka ururin jiray oo la diriray
Muuse iyo Haaruun oo ku jiray kooxdii Qorax markii ay
Rabbiga la dirireen, 10 oo uu dhulku afka kala qaaday oo
liqay iyagii iyo Qorax markii kooxdaasu ay dhinteen, kolkii
dabku baabbi'iyey labada boqol iyo kontonka nin oo ay
calaamad noqdeen. 11 Habase yeeshee Qorax wiilashiisii
ma ay dhiman. 12 Wiilashii Simecoon iyo qabiilooyinkoodii
ka soo farcamay waa kuwan: Nemuu'eel oo dhalay qabiilka
reer Nemuu'eel, iyo Yaamiin oo dhalay qabiilka reer Yaamiin,
iyo Yaakiin oo dhalay qabiilkii reer Yaakiin, 13 iyo Serax oo

dhalay qabiilkii reer Serax, iyo Shaa'uul oo dhalay qabiilkii
reer Shaa'uul. 14 Intaasu waa qabiilooyinkii reer Simecoon,
oo waxay ahaayeen laba iyo labaatan kun iyo laba boqol.
15 Wiilashii Gaad iyo qabiilooyinkii ka soo farcamay waa
kuwan: Sefoon oo dhalay qabiilka reer Sefoon, iyo Xaggii oo
dhalay qabiilka reer Xaggii, iyo Shuunii oo dhalay qabiilka
reer Shuunii, 16 iyo Aasnii oo dhalay qabiilka reer Aasnii, iyo
Ceerii oo dhalay qabiilka reer Ceerii, 17 iyo Arood oo dhalay
qabiilka reer Arood, iyo Areelii oo dhalay qabiilka reer Areelii.
18 Intaasu waa qabiilooyinkii reer Gaad, oo intii iyaga laga
tiriyey waxay ahaayeen afartan kun iyo shan boqol. 19 Oo
wiilashii Yahuudahna waxay ahaayeen Ceer iyo Oonaan; oo
Ceer iyo Oonaanna waxay ku dhinteen dalkii Kancaan. 20 Oo
wiilashii Yahuudah iyo qabiilooyinkoodiina waxay ahaayeen:
Sheelaah oo dhalay qabiilka reer Sheelaah, iyo Feres oo
dhalay qabiilka reer Feres, iyo Serax oo dhalay qabiilka reer
Serax. 21 Feres wiilashiisiina waxay ahaayeen: Xesroon
oo dhalay qabiilka reer Xesroon, iyo Xaamuul oo dhalay
qabiilka reer Xaamuul. 22 Intaasu waa qabiilooyinkii reer
Yahuudah oo intii iyaga laga tiriyey waxay ahaayeen lix iyo
toddobaatan kun iyo shan boqol. 23 Oo wiilashii Isaakaar iyo
qabiilooyinkoodii waa kuwan: Toolac oo dhalay qabiilka reer
Toolac, iyo Fuwaah oo dhalay qabiilka reer Fuwaah, 24 iyo
Yaashuub oo dhalay qabiilka reer Yaashuub, iyo Shimroon oo
dhalay qabiilka reer Shimroon. 25 Intaasu waa qabiilooyinkii
reer Isaakaar, oo intii iyaga laga tiriyeyna waxay ahaayeen
afar iyo lixdan kun iyo saddex boqol. 26 Oo wiilashii Sebulun
iyo qabiilooyinkoodiina waa kuwan: Sered oo dhalay qabiilka
reer Sered, iyo Eeloon oo dhalay qabiilka reer Eeloon, iyo
Yaxle'eel oo dhalay qabiilka reer Yaxle'eel. 27 Intaasu waa
qabiilooyinkii reer Sebulun, oo intii iyaga laga tiriyey waxay
ahaayeen lixdan kun iyo shan boqol. 28 Oo wiilashii Yuusuf
iyo qabiilooyinkoodii waxay ahaayeen Manaseh iyo Efrayim.
29 Oo wiilashii Manaseh waa kuwan: Maakiir oo dhalay
qabiilka reer Maakiir, oo Maakiirna wuxuu dhalay Gilecaad,
Gilecaadna waxaa ka soo farcamay qabiilka reer Gilecaad.
30 Wiilashii Gilecaad waa kuwan: Iiceser oo dhalay qabiilka
reer Iiceser, iyo Xeeleq oo dhalay qabiilka reer Xeeleq, 31
iyo Asrii'eel oo dhalay qabiilka reer Asrii'eel, iyo Shekem oo
dhalay qabiilka reer Shekem, 32 iyo Shemiidaac oo dhalay
qabiilka reer Shemiidaac, iyo Heefer oo dhalay qabiilka reer
Heefer. 33 Oo Selaafexaad oo ahaa ina Heefer wiilal ma
uu lahayn gabdho mooyaane. Oo Selaafexaad gabdhihiisa
magacyadoodu waxay ahaayeen Maxlaah iyo Nocaah iyo
Xoglaah iyo Milkaah iyo Tirsaah. 34 Intaasu waa qabiilooyinkii
reer Manaseh, oo intii iyaga laga tiriyey waxay ahaayeen
laba iyo konton kun iyo toddoba boqol. 35 Oo wiilashii
Efrayim iyo qabiilooyinkoodii waa kuwan: Shuutelax oo
dhalay qabiilka reer Shuutelax, iyo Beker oo dhalay qabiilka
reer Beker, iyo Tahan oo dhalay qabiilka reer Tahan. 36
Intanuna waa wiilashii Shuutelax: Ceeraan oo dhalay qabiilka
reer Ceeraan. 37 Intaasu waa qabiilooyinkii wiilashii Efrayim,
oo intii iyaga laga tiriyey waxay ahaayeen laba iyo soddon
kun iyo shan boqol. Kuwaasu waxay ahaayeen wiilashii
Yuusuf iyo qabiilooyinkoodii. 38 Oo wiilashii Benyaamiin iyo
qabiilooyinkoodiina waa kuwan: Belac oo dhalay qabiilka
reer Belac, iyo Ashbeel oo dhalay qabiilka reer Ashbeel, iyo
Axiiraam oo dhalay qabiilka reer Axiiraam, 39 iyo Shefuufaan
oo dhalay qabiilka reer Shefuufaan, iyo Xuufaam oo dhalay
qabiilka reer Xuufaam. 40 Oo wiilashii Belac waxay ahaayeen
Ared iyo Nacamaan. Oo Ared wuxuu dhalay qabiilka reer
Ared, Nacamaanna wuxuu dhalay qabiilka reer Nacamaan.
41 Intaasu waa wiilashii Benyaamiin iyo qabiilooyinkoodii, oo
intii iyaga laga tiriyey waxay ahaayeen shan iyo afartan kun
iyo lix boqol. 42 Oo wiilashii Daan iyo qabiilooyinkoodiina
waa kuwan: Shuuxaam oo dhalay qabiilka reer Shuuxaam.
Intaasu waa qabiilooyinkii reer Daan, siday qabiilooyinkoodii
ahaayeen. 43 Oo qabiilooyinkii reer Shuuxaam oo dhan intii
iyaga laga tiriyey waxay ahaayeen afar iyo lixdan kun iyo
afar boqol. 44 Oo wiilashii Aasheer iyo qabiilooyinkoodiina
waa kuwan: Yimnaah oo dhalay qabiilka reer Yimnaah, iyo
Yishwii oo dhalay qabiilka reer Yishwii, iyo Beriicaah oo
dhalay reer Beriicaah. 45 Oo wiilashii Beriicaah waxaa ka
soo farcamay: Xeber oo dhalay qabiilka reer Xeber, iyo
Malkii'eel oo dhalay qabiilka reer Malkii'eel. 46 Oo Aasheer
gabadhiisii magaceediina wuxuu ahaa Serax. 47 Oo intaasu
waa qabiilooyinkii reer Aasheer, oo intii iyaga laga tiriyeyna
waxay ahaayeen saddex iyo konton kun iyo afar boqol.
48 Oo wiilashii Naftaali iyo qabiilooyinkoodii waa kuwan:
Yaxse'eel oo dhalay qabiilka reer Yaxse'eel, iyo Guunii
oo dhalay qabiilka reer Guunii; 49 iyo Yeser oo dhalay
qabiilka reer Yeser, iyo Shilleem oo dhalay qabiilka reer
Shilleem. 50 Intaasu waa qabiilooyinkii reer Naftaali sidii
ay qabiilooyinkoodu ahaayeen. Oo intii iyaga laga tiriyey
waxay ahaayeen shan iyo afartan kun iyo afar boqol. 51
Intaasu waa intii laga tiriyey reer binu Israa'iil, oo waxay
kulligood ahaayeen lix boqol oo kun iyo toddoba boqol
iyo soddon. 52 Markaasaa Rabbigu Muuse la hadlay oo
wuxuu ku yidhi, 53 Kuwan ayaa dalka dhaxal ahaan loogu
qaybin doonaa sida ay tahay tirada magacyadoodu. 54 Kuwii
badan waa inaad siisaa dhaxal badan oo kuwii yarna waa
inaad siisaa dhaxal yar. Oo mid kasta sida kuwii laga tiriyey
ay ahaayeen dhaxalka ha loo siiyo. 55 Habase yeeshee
dhulka waa in saami loo ritaa marka la qaybsanayo. Sida

magacyada qabiilooyinka awowayaashoodu ahaayeen ha u
dhaxleen. 56 Oo kuwa badan iyo kuwa yarba dhaxalkooda
saami ha lagu kala qaybiyo. 57 Kuwii laga tiriyey reer Laawi
iyo qolooyinkoodii waa kuwan: Gershoon oo dhalay qabiilka
reer Gershoon, iyo Qohaad oo dhalay qabiilka reer Qohaad,
iyo Meraarii oo dhalay qabiilka reer Meraarii. 58 Intanu waa
qabiilooyinkii reer Laawi: qabiilkii reer Libnii, iyo qabiilkii reer
Xebroon, iyo qabiilkii reer Maxlii, iyo qabiilkii reer Mushii, iyo
qabiilkii reer Qorax. Oo Qohaadna wuxuu dhalay Camraam.
59 Oo Camraam naagtiisu waxay ahayd Yookebed ina Laawi,
taasoo Laawi ugu dhalatay dalkii Masar. Oo iyana waxay
Camraam u dhashay Haaruun iyo Muuse iyo walaashood
Maryan. 60 Oo Haaruun waxaa u dhashay Naadaab iyo
Abiihuu iyo Elecaasaar iyo Iitaamaar. 61 Oo Naadaab iyo
Abiihuu way dhinteen markay Rabbiga hortiisa ku bixiyeen
dab qalaad. 62 Oo intii iyaga laga tiriyey waxay ahaayeen
saddex iyo labaatan kun, mid kasta oo lab ah oo bil jira
iyo intii ka sii weyn, waayo, iyaga laguma tirin reer binu
Israa'iil, maxaa yeelay, dhaxal laguma siin reer binu Israa'iil
dhexdooda. 63 Kuwaasu waa kuwii ay tiriyeen Muuse iyo
wadaadkii Elecaasaar ahaa oo ku tiriyey reer binu Israa'iil
bannaankii Moo'aab oo webi Urdun ku ag yaal oo Yerixoo ka
soo hor jeeda. 64 Laakiinse kuwaas nin keliyuhu kagama
jirin kuwii ay Muuse iyo wadaadkii Haaruun ahaa tiriyeen
markay reer binu Israa'iil ku tiriyeen cidladii Siinay. 65
Waayo, Rabbigu wuxuu iyaga ka yidhi, Hubaal cidlada bay
ku dhiman doonaan. Oo nin qudhuhu kama hadhin, Kaaleeb
ina Yefunneh iyo Yashuuca ina Nuun mooyaane.

27 Markaas waxaa soo dhowaaday gabdhihii Selaafexaad
ina Heefer ina Gilecaad oo ahaa ina Maakiir ina
Manaseh, oo ahaa reer Manaseh ina Yuusuf; oo magacyadii
gabdhihiisiina waa kuwan: Maxlaah iyo Nocaah iyo Xoglaah
iyo Milkaah iyo Tirsaah. 2 Oo iyana markaasay is-hor taageen
Muuse, iyo wadaadkii Elecaasaar ahaa, iyo amiirradii iyo
shirka oo dhan, xagga iriddii teendhada shirka, oo waxay
yidhaahdeen, 3 Aabbahayo wuxuu ku dhintay cidladii,
laakiinse isagu kuma uu jirin kooxdii is-urursatay oo Rabbiga
geesta ka ahayd, oo kooxdii Qorax ahayd, illowse isagu
wuxuu u dhintay dembi uu isagu lahaa, oo isagu wiilalna
ma uu lahayn. 4 In kastoo uusan wiilal lahayn magicii
aabbahayo maxaa qabiilkiisa looga dhex baabbi'inayaa?
Haddaba aabbahayo walaalihiis dhul dhaxal ah nagu dhex
sii. 5 Markaasaa Muuse arrintoodii keenay Rabbiga hortiisa.
6 Markaasaa Rabbigu Muuse la hadlay, oo wuxuu ku yidhi,
7 Gabdhaha Selaafexaad wax qumman bay ku hadleen.
Haddaba hubaal waa inaad dhul dhaxal ah aabbahood
walaalihiis ka dhex siisaa, oo waa inaad iyaga aabbahood ka
dhaxalsiisaa. 8 Oo waa inaad reer binu Israa'iil la hadashaa,
oo waxaad iyaga ku tidhaahdaa, Haddii nin dhinto oo uusan
wiil lahayn, markaas waa inaad gabadhiisa dhaxalsiisaan.
9 Oo hadduusan gabadhna lahayn, markaas waa inaad
dhaxalsiisaan walaalihiis. 10 Oo hadduusan walaalo lahaynna
markaas waa inaad adeerradiis dhaxalsiisaan. 11 Oo
hadduusan aabbihiis walaalo lahaynna markaas waa inaad
dhaxalsiisaan mid xigtadiisa ah oo isagu ha lahaado. Oo
taasu qaynuun xukun ah bay u ahaan doontaa reer binu
Israa'iil, sida Rabbigu Muuse ku amray. 12 Kolkaasaa
Rabbigu Muuse ku yidhi, Buurtan Cabaariim soo fuul, oo bal
fiiri dalka aan reer binu Israa'iil siiyey. 13 Oo markaad aragtid
dabadeed dadkaagii dhintay waad ku darman doontaa, sidii
walaalkaa Haaruunba ugu darmaday, 14 maxaa yeelay,
eraygayga baad kaga caasideen cidladii Sin markay dadka
shirku dirireen ee aad aniga quduus igaga dhigi weydeen
biyaha agtooda, iyagoo u jeeda. (Kuwaasu waa biyihii
Meriibaah oo ku yaal Qaadeesh oo ah cidlada Sin.) 15
Markaasaa Muuse Rabbiga la hadlay, oo wuxuu ku yidhi,
16 Rabbiga ah Ilaaha ruuxyada binu-aadmiga oo dhan, ha
doorto nin u taliya shirka, 17 oo hortooda dibadda ugu
baxa, oo hortooda gudaha soo gala, oo iyaga dibadda u
hoggaamiya, oo gudaha soo geliya inaan shirka Rabbigu
ahaan sidii ido aan idojir lahayn. 18 Markaasaa Rabbigu
Muuse ku yidhi, Waxaad soo waddaa Yashuuca ina Nuun
oo ah nin Ruuxu ku jiro, oo gacanta dul saar isaga. 19 Oo
waxaad isaga soo hor taagtaa wadaadka Elecaasaar ah iyo
shirka oo dhan, oo hortooda amar ku sii. 20 Oo waxaad
isaga dul saartaa sharaftaadii, si shirka reer binu Israa'iil oo
dhammu ay isaga u addeecaan. 21 Oo isagu waa inuu is-hor
taagaa wadaadka Elecaasaar ah oo isaga wax ugu weyddiin
doona xukunka Uuriimka Rabbiga hortiisa. Iyagu eraygiisay
dibadda ugu bixi doonaan, oo eraygiisay gudaha ku soo
geli doonaan, isaga iyo reer binu Israa'iilka isaga la jiraaba,
kuwaas oo ah shirka oo dhan. 22 Markaasaa Muuse yeelay
sidii Rabbigu ku amray, oo wuxuu soo waday Yashuuca,
kolkaasuu soo hor taagay wadaadkii Elecaasaar ahaa iyo
shirkii oo dhan. 23 Oo gacmuhuu dul saaray, oo amar buu
siiyey, sidii Rabbigu Muuse kula hadlay.

28 Kolkaasaa Rabbigu Muuse la hadlay, oo wuxuu ku
yidhi, 2 Reer binu Israa'iil amar, oo waxaad ku
tidhaahdaa, Qurbaankayga oo ah cuntada qurbaannada
dabka la iigu sameeyo oo carafta udgoon ii ah waa inaad
dhawrtaan inaad wakhtigoodii bixisaan. 3 Oo waxaad iyaga
ku tidhaahdaa, Kanu waa qurbaanka dabka lagu sameeyo
oo aad Rabbiga u bixisaan laba wan oo gu jir ah oo aan iin

lahayn oo aad maalin kasta qurbaan la gubo oo joogto ah u
bixisaan. 4 Waa inaad wan bixisaa aroortii, wanka kalena
makhribkii. 5 Oo waxaad la bixisaa oo qurbaan hadhuudh ka
dhigtaa eefaah bur ah oo toban meelood loo dhigay meeshiis
oo lagu daray hiin rubuceed oo ah saliid saafi ah. 6 Kaasu
waa qurbaan la gubo oo joogto ah oo Buur Siinay laga
amray inuu ahaado qurbaan dab loogu sameeyo Rabbiga oo
caraf udgoon u ah. 7 Oo wan qurbaankiisa cabniinku waa
inuu ahaadaa hiin rubuceed, oo meesha quduuska ah waa
inaad Rabbiga ugu shubtaa qurbaan cabniin oo ah khamri
culus. 8 Oo wanka kalena waa inaad makhribka bixisaa, oo
qurbaankiisii hadhuudhka iyo qurbaankiisii cabniinka waa
inaad isaga la bixisaa sida kii aroortii oo kale, waayo, waa
qurbaan dab lagu sameeyo oo Rabbiga u ah caraf udgoon. 9
Oo maalinta sabtidana waxaad bixisaa laba wan oo wada gu
jir ah oo aan iin lahayn, iyo eefaah bur ah oo toban meelood
loo dhigay labadiis meelood ee qurbaan hadhuudh ah oo
saliid lagu daray iyo qurbaankiisii cabniinka. 10 Kaasu waa
qurbaanka la gubo oo sabtida, oo ayan qurbaanka la gubo
oo joogtada ah iyo qurbaankiisa cabniinku ku jirin. 11 Oo
bilowga bilihiinnana waa inaad Rabbiga qurbaan la gubo ugu
bixisaan laba dibi oo yaryar, iyo wan weyn, iyo toddoba wan
oo yaryar oo wada gu jir ah oo aan iin lahayn, 12 oo eefaah
bur ah toban meelood loo dhigay saddexdiis meelood oo
saliid lagu daray waa inaad qurbaan hadhuudh ula bixisaan
dibi kasta, oo eefaah bur ah oo toban meelood loo dhigay
labadiis meelood oo saliid lagu daray waa inaad qurbaan
hadhuudh ula bixisaan wanka weyn. 13 Oo wan kasta oo
yarna waxaad qurbaan hadhuudh ula bixisaan eefaah bur
ah oo toban meelood loo dhigay meeshiis oo saliid lagu
daray, kaasoo wada ah qurbaan la gubo oo caraf udgoon ah
oo Rabbiga dab loogu sameeyo. 14 Oo qurbaannadooda
cabniinkuna waa inay ahaadaan hiin nuskeed khamri ah
dibigiiba, iyo hiin saddex daloolkeed oo wanka weyn la
socdaa, iyo hiin rubuceed oo wanka yar la socdaa. Intaasu
waa qurbaanka la gubo oo ay tahay inaad bixisaan bil kasta
bilaha sannaddii oo dhan. 15 Oo waa inaad orgi Rabbiga
ugu bixisaan qurbaan dembi, oo ayan qurbaanka la gubo
oo joogtada ah iyo qurbaankiisa cabniinku ku jirin. 16 Oo
bisha kowaad maalinteeda afar iyo tobnaadna waa wakhtiga
Kormaridda Rabbiga. 17 Oo bishaas maalinteeda shan iyo
tobnaadna waa in iidi jirtaa. Toddoba maalmood waa in kibis
aan khamiir lahayn la cunaa. 18 Oo maalinta kowaadna
waa in la yeesho shir quduus ah. Idinku waa inaydaan
innaba shuqul caadi ah samayn, 19 laakiinse waa inaad
bixisaan qurbaan dab lagu sameeyo, kaas oo ah qurbaan
loo gubo Rabbiga, oo ah laba dibi oo yaryar, iyo wan weyn,
iyo toddoba wan oo yaryar oo wada gu jir ah. Waa inay
idiin ahaadaan kuwa aan iin lahayn. 20 Oo qurbaankooda
hadhuudhkuna wuxuu ahaan doonaa bur saliid lagu daray.
Burka toban meelood loo dhigay saddexdiis meelood waa
inaad dibiba la bixisaan, labadiis meeloodna wanka weyn,
21 iyo meeshiisna toddobada wan oo yaryar midkood kasta.
22 Oo waa inaad orgi qurbaan dembi u bixisaan si laydiinku
kafaaro gudo. 23 Kuwaas waa inaad bixisaan iyadoo uusan
ku jirin qurbaanka la gubo oo subaxnimada, kaasoo ah
qurbaan la gubo oo joogto ah. 24 Sidan waa inaad maalin
kasta intii toddoba maalmood ah u bixisaan cuntada ah
qurbaanka dabka lagu sameeyo oo Rabbiga caraf udgoon u
ah. Taas waa in la bixiyaa iyadoo ayan qurbaanka la gubo
oo joogtada ah iyo qurbaankiisa cabniinka ahu ku jirin. 25
Oo maalinta toddobaadna waa inaad yeelataan shir quduus
ah, oo waa inaydaan innaba shuqul caadi ah samayn.
26 Oo weliba maalinta midhaha hore la goosto, markaad
qurbaan hadhuudh oo cusub Rabbiga ugu bixisaan iidda
toddobaadyada waa inaad shir quduus ah yeelataan; oo
waa inaydaan innaba shuqul caadi ah samayn. 27 Laakiinse
waa inaad qurbaan la gubo oo caraf udgoon ah Rabbiga
ugu bixisaan laba dibi oo yaryar, iyo wan weyn, iyo toddoba
wan oo yaryar oo wada gu jir ah, 28 oo waxaad la bixisaan
qurbaankooda hadhuudhka ah oo ah bur saliid lagu daray,
oo burkii tobankii meelood dibigii kasta saddex meelood la
bixi, oo wankana laba meelood la bixi, 29 oo toddobada
wan oo yaryarna midkood kasta meel la bixi. 30 Oo waa
inaad bixisaan orgi laydiinku kafaaro gudo. 31 Oo iyaga
iyo qurbaannadooda cabniinka waa inaad bixisaan iyadoo
ayan qurbaanka la gubo oo joogtada ah iyo qurbaankiisa
hadhuudhka ahu ku jirin (oo waa inay idiin ahaadaan kuwa
aan iin lahayn).

**29** Oo bisha toddobaad, maalinteeda kowaad, waa inaad
yeelataan shir quduus ah; oo waa inaydaan innaba
shuqul caadi ah samayn, waayo, waa maalin buunan laydiin
afuufo. 2 Oo waa inaad qurbaan la gubo oo caraf udgoon ah
Rabbiga ugu bixisaan dibi yar iyo wan weyn iyo toddoba wan
oo yaryar oo wada gu jir ah oo aan iin lahayn, 3 oo waxaad la
bixisaan qurbaankoodii hadhuudhka ah oo ah bur saliid lagu
daray, oo burkii tobankii meelood saddex meelood dibiga
la bixi, wankana laba meelood, 4 oo toddobada wan oo
yaryarna wankiiba meel la bixi. 5 Oo waa inaad orgi qurbaan
dembi u bixisaan si laydiinku kafaaro gudo, 6 oo ayan ku
jirin qurbaanka la gubo ee bisha cusub, iyo qurbaankiisa
hadhuudhka ah, iyo qurbaanka la gubo oo joogtada ah,
iyo qurbaankiisa hadhuudhka ah, iyo qurbaannadooda

cabniinka ah, sidii qaynuunkoodu ahaa, kuwaasoo wada ah
caraf udgoon ee ah qurbaan Rabbiga dab loogu sameeyo.
7 Oo bishaas toddobaad, maalinteeda tobnaad, waxaad
yeeshaan shir quduus ah, oo waa inaad nafihiinna dhibtaan,
oo waa inaydaan innaba shuqul samayn cayn kasta ha
ahaadee, 8 laakiinse waa inaad Rabbiga qurbaan la gubo
oo caraf udgoon ah ugu bixisaan dibi yar iyo wan weyn
iyo toddoba wan oo yaryar oo wada gu jir ah, oo waa
inay idiin ahaadaan kuwa aan iin lahayn, 9 oo waxaad la
bixisaan qurbaankoodii hadhuudhka ah oo ah bur saliid
lagu daray, oo burka tobankii meelood saddex meelood
dibiga la bixi, wankana laba meelood, 10 oo toddobada wan
oo yaryarna wankiiba meel la bixi. 11 Oo waa inaad orgi
qurbaan dembi u bixisaan, oo ayan qurbaanka dembiga
oo kafaaraggudka ah, iyo qurbaanka la gubo oo joogtada
ah, iyo qurbaankiisii hadhuudhka ah iyo qurbaannadooda
cabniinka ahu ku jirin. 12 Oo bisha toddobaad maalinteeda
shan iyo tobnaad waa inaad yeelataan shir quduus ah, oo
waa inaydaan innaba shuqul caadi ah samayn, oo waa inaad
inta toddoba maalmood ah Rabbiga iid u samaysaan. 13 Oo
waa inaad bixisaan qurbaan la gubo oo ah qurbaan dab lagu
sameeyo oo Rabbiga caraf udgoon u ah, oo ah saddex iyo
toban dibi oo yaryar, iyo laba wan oo waaweyn, iyo afar
iyo toban wan oo yaryar oo wada gu jir ah, oo waa inay
ahaadaan kuwo aan iin lahayn, 14 oo waxaad la bixisaan
qurbaankooda hadhuudhka ah oo ah bur saliid lagu daray,
oo burkii tobankii meelood saddex meelood saddex iyo
tobanka dibi midkiiba la bixi, oo labada wan oo waaweynna
midkiiba laba meelood la bixi, 15 oo saddex iyo tobanka
wan oo yaryarna mid kasta meel la bixi. 16 Oo weliba orgi
waa inaad u bixisaan qurbaan dembi, oo ayan qurbaanka
la gubo oo joogtada ah iyo qurbaankiisa hadhuudhka ah,
iyo qurbaankiisa cabniinka ahu ku jirin. 17 Oo maalinta
labaadna waxaad bixisaan laba iyo toban dibi oo yaryar, iyo
laba wan oo waaweyn, iyo afar iyo toban wan oo yaryar oo
wada gu jir ah oo aan iin lahayn. 18 Oo dibida iyo wananka
waaweyn iyo wananka yaryarba qurbaankooda hadhuudhka
ah iyo qurbaankooda cabniinka ahba waa inaad u bixisaan
sida tiradoodu tahay oo qaynuunka waafaqsan. 19 Oo waa
inaad orgi u bixisaan qurbaan dembi, oo ayan qurbaanka
la gubo oo joogtada ah, iyo qurbaankiisa hadhuudhka ah,
iyo qurbaankiisa cabniinka ahu ku jirin. 20 Oo maalinta
saddexaadna waxaad bixisaan kow iyo toban dibi, iyo laba
wan oo waaweyn, iyo afar iyo toban wan oo yaryar oo
wada gu jir ah oo aan iin lahayn. 21 Oo dibida iyo wananka
waaweyn iyo wananka yaryarba qurbaankooda hadhuudhka
ah iyo qurbaankooda cabniinka ahba waa inaad u bixisaan
sida tiradoodu tahay oo qaynuunka waafaqsan. 22 Oo waa
inaad orgi u bixisaan qurbaan dembi, oo ayan qurbaanka
la gubo oo joogtada ah, iyo qurbaankiisa hadhuudhka ah,
iyo qurbaankiisa cabniinka ahu ku jirin. 23 Oo maalinta
afraadna waxaad bixisaan toban dibi, iyo laba wan oo
waaweyn, iyo afar iyo toban wan oo yaryar oo wada gu jir
ah oo aan iin lahayn. 24 Oo dibida iyo wananka waaweyn
iyo wananka yaryarba qurbaankooda hadhuudhka ah iyo
qurbaankooda cabniinka ahba waa inaad u bixisaan sida
tiradoodu tahay oo qaynuunka waafaqsan. 25 Oo waa
inaad orgi u bixisaan qurbaan dembi, oo ayan qurbaanka
la gubo oo joogtada ah, iyo qurbaankiisa hadhuudhka ah
iyo qurbaankiisa cabniinka ahu ku jirin. 26 Oo maalinta
shanaadna waxaad bixisaan sagaal dibi, iyo laba wan oo
waaweyn, iyo afar iyo toban wan oo yaryar oo wada gu jir
ah oo aan iin lahayn. 27 Oo dibida iyo wananka waaweyn
iyo wananka yaryarba qurbaankooda hadhuudhka ah, iyo
qurbaankooda cabniinka ahba waa inaad u bixisaan sida
tiradoodu tahay oo qaynuunka waafaqsan. 28 Oo waa
inaad orgi u bixisaan qurbaan dembi, oo ayan qurbaanka
la gubo oo joogtada ah, iyo qurbaankiisa hadhuudhka ah,
iyo qurbaankiisa cabniinka ahu ku jirin. 29 Oo maalinta
lixaadna waxaad bixisaan siddeed dibi, iyo laba wan oo
waaweyn, iyo afar iyo toban wan oo yaryar oo wada gu jir
ah oo aan iin lahayn. 30 Oo dibida iyo wananka waaweyn
iyo wananka yaryarba qurbaankooda hadhuudhka ah iyo
qurbaankooda cabniinka ahba waa inaad u bixisaan sida
tiradoodu tahay oo qaynuunka waafaqsan. 31 Oo waa
inaad orgi u bixisaan qurbaan dembi, oo ayan qurbaanka
la gubo oo joogtada ah, iyo qurbaankiisa hadhuudhka ah,
iyo qurbaankiisa cabniinka ahu ku jirin. 32 Oo maalinta
toddobaadna waxaad bixisaan toddoba dibi, iyo laba wan
oo waaweyn, iyo afar iyo toban wan oo yaryar oo wada
gu jir ah oo aan iin lahayn. 33 Oo dibida iyo wananka
waaweyn iyo wananka yaryarba qurbaankooda hadhuudhka
ah iyo qurbaankooda cabniinka ahba waa inaad u bixisaan
sida tiradoodu tahay oo qaynuunka waafaqsan. 34 Oo waa
inaad orgi u bixisaan qurbaan dembi, oo ayan qurbaanka
la gubo oo joogtada ah, iyo qurbaankiisa hadhuudhka ah,
iyo qurbaankiisa cabniinka ahu ku jirin. 35 Oo maalinta
siddeedaadna waa inaad yeelataan shir quduus ah, oo waa
inaydaan innaba shuqul caadi ah samayn, 36 laakiinse
waxaad bixisaan qurbaan la gubo, kaasoo ah qurbaan dab
lagu sameeyo oo Rabbiga u ah caraf udgoon, oo waa
dibi iyo wan weyn iyo toddoba wan oo yaryar oo wada
gu jir ah oo aan iin lahayn. 37 Oo dibiga iyo wanka weyn
iyo wananka yaryarba qurbaankooda hadhuudhka ah iyo

qurbaankooda cabniinka ahba waa inaad u bixisaan sida
tiradoodu tahay oo qaynuunka waafaqsan. **38** Oo waa
inaad orgi u bixisaan qurbaan dembi, oo ayan qurbaanka la
gubo oo joogtada ah, iyo qurbaankiisa hadhuudhka ah, iyo
qurbaankiisa cabniinka ahu ku jirin. **39** Kuwaas waa inaad
Rabbiga u bixisaan iidihiinna xilligooda, kuwaasoo ayan
ku jirin nidarradiinna iyo qurbaannadiinna ikhtiyaarka ah,
kuwaasu waa qurbaannadiinna la gubo, iyo qurbaannadiinna
hadhuudhka ah, iyo qurbaannadiinna cabniinka ah, iyo
qurbaannadiinna nabaadiinada. **40** Oo Muuse wuxuu reer
binu Israa'iil u sheegay kulli wixii Rabbigu Muuse ku amray
oo dhan.

**30** Kolkaasaa Muuse madaxdii qabiilooyinka reer binu
Israa'iil la hadlay, oo wuxuu ku yidhi, Intanu waa
wixii Rabbigu amray. **2** Markii nin Rabbiga nidar u nidro,
amase uu dhaar ugu dhaarto oo uu naftiisa sidaas ugu
xidho, waa inuusan eraygiisa jebin. Waa inuu sameeyaa
kulli wixii afkiisa ka soo baxay oo dhan. **3** Qof dumar ahuna
markay Rabbiga nidar u nidarto oo ay sidaas nafteeda ugu
xidho, oo ay gurigii aabbaheed joogto iyadoo dhallinyaro
ah, **4** haddii aabbaheed maqlo nidarkeeda iyo dhaarteedii
ay nafteeda ku xidhay, oo uu markaas iska aamuso, de
markaas nidarradeedii oo dhammu way taagnaan doonaan,
oo dhaar kastoo ay nafteeda ku xidhayna waa taagnaan
doontaa. **5** Laakiinse haddii aabbaheed u diido maalintii uu
maqlo, nidarradeedii iyo dhaaraheedii ay nafteeda ku xidhay
midkoodna taagnaan maayo, oo Rabbiguna wuu cafiyayaa
iyada, maxaa yeelay, aabbaheed baa u diiday. **6** Oo hadday
nin leedahay iyadoo ay kor saaran yihiin nidarradeedii iyo
hadalkii degdegga ahaa oo bushimaheeda ka baxay oo ay
nafteeda ku xidhay, **7** haddii ninkeedu maqlo oo uu iska
aamuso maalintii uu maqlo, markaas nidarradeedii way
taagnaan doonaan, oo dhaaraheedii ay nafteeda ku xidhayna
way taagnaan doonaan. **8** Laakiinse haddii ninkeedu u
diido maalintii uu maqlo, markaasuu burin doonaa nidarkii
saarnaa iyo hadalkii degdegga ahaa oo bushimaheeda ka
baxay oo ay nafteeda ku xidhay; oo Rabbiguna iyada wuu
cafiyi doonaa. **9** Laakiinse carmal laga dhintay, amase tii la
furay, nidarkeeda iyo xataa waxa kastoo ay nafteeda ku
xidhayba way taagnaan doonaan. **10** Oo hadday nidar gasho
ama ay nafteeda dhaar ku xidho iyadoo guriga ninkeeda
joogta, **11** oo haddii ninkeedu maqlo oo uu iska aamuso ee
uusan iyada u diidin, markaas nidarradeedii oo dhammu way
taagnaan doonaan, oo dhaar kastoo ay nafteeda ku xidhayna
way taagnaan doontaa. **12** Laakiinse haddii ninkeedu uu
iyaga buriyo maalintii uu maqlay, markaas wax alla wixii
bushimaheeda ka soo baxay oo nidarradeeda ku saabsan
amase ku saabsan dhaartii ay nafteeda ku xidhay ma
ay taagnaan doonaan, waayo, ninkeedii baa buriyey, oo
Rabbiguna wuu cafiyi doonaa iyada. **13** Nidar kasta iyo dhaar
kasta oo nafta lagu xidho in lagu dhibo aawadeed, ninkeedaa
adkayn kara ama ninkeedaa burin kara. **14** Laakiinse haddii
ninkeedu maalin ka maalin ka aamuso iyada, markaas wuu
adkeeyaa nidarradeedii oo dhan iyo dhaaraheedii iyada
saarnaa oo dhan. Wuu adkeeyey, maxaa yeelay, wuu isaga
aamusay maalintii uu maqlay. **15** Laakiinse hadduu buriyo
markuu maqlay dabadeed, de markaas isagaa qaadaya
dembigeedii. **16** Kuwanu waa qaynuunnadii Rabbigu ku
amray Muuse, ee u dhexeeya nin iyo naagtiis, oo u dhexeeya
aabbe iyo gabadhiis dhallinyaro ah oo guriga aabbaheed
joogta.

**31** Markaasaa Rabbigu Muuse la hadlay oo wuxuu ku
yidhi, **2** Reer binu Israa'iil uga aargud reer Midyaan,
oo taas dabadeedna dadkaagaad ku darman doontaa. **3**
Markaasaa Muuse dadkii la hadlay, oo wuxuu ku yidhi, War
idinku dhexdiinna rag dagaal uga diyaariya, oo hub siiya,
inay reer Midyaan ku kacaan, oo ay Rabbiga reer Midyaan
uga aargudaan. **4** Oo qabiilooyinka reer binu Israa'iil oo dhan
waa inaad qabiil kastaba kun ka soo bixisaan oo dagaal u
dirtaan. **5** Sidaas daraaddeed kumanyaalkii reer binu Israa'iil
qabiil kasta waxaa laga soo bixiyey kun nin, oo waxay
ahaayeen laba iyo toban kun oo nin oo dagaal hub u sita. **6**
Markaasaa Muuse qabiilba kun dagaalka uga diray, iyagii iyo
Fiinexaas wadaadkii Elecaasaar wiilkiisii ahaa isagoo wada
alaabtii meesha quduuska ah iyo turumbooyinkii dhawaaqa
digtoonaanta oo gacanta ugu jira. **7** Oo waxay la dirireen
reer Midyaan sidii Rabbigu Muuse ugu amray, oo waxay
dileen mid kasta oo lab ahaa. **8** Oo boqorradii reer Midyaan
ayay la dileen kuwii kaloo la laayay, oo shantii boqor oo
reer Midyaan waxay ahaayeen Ewii, iyo Reqem, iyo Suur,
iyo Xuur, iyo Rebac; oo Balcaam oo ahaa ina Becoorna
seef bay ku dileen. **9** Oo reer binu Israa'iil waxay maxaabiis
ahaan u wateen dumarkii reer Midyaan iyo dhallaankoodiiba;
oo lo'doodii oo dhan, iyo idahoodii oo dhan, iyo alaabtoodii
oo dhanna way wada dheceen. **10** Oo magaalooyinkoodii ku
yiil meelihii ay degganaayeen iyo xerooyinkoodii oo dhan
way wada gubeen. **11** Oo dad iyo duunyaba way dheceen
oo booli bay u qaateen. **12** Oo maxaabiistii iyo boolidii iyo
wixii la soo dhacay waxay u keeneen Muuse iyo wadaadkii
Elecaasaar ahaa iyo shirkii reer binu Israa'iil oo dhan oo
joogay xeradii ku tiil bannaankii Moo'aab oo Webi Urdun u
dhowaa oo Yerixoo ka soo hor jeeday. **13** Markaasaa Muuse

iyo wadaadkii Elecaasaar ahaa iyo shirka amiirradiisii oo
dhammu waxay u bexeen inay kaga hor tagaan xerada
dibaddeeda. **14** Markaasaa Muuse u cadhooday saraakiishii
ciidanka, kuwaas oo ahaa kun-u-taliyayaashii iyo boqol-u-
taliyayaashii ka yimid hawshii dagaalka. **15** Oo Muuse wuxuu
iyagii ku yidhi, War dumarkii oo dhan miyaad badbaadiseen?
**16** Bal eeg, taladii Balcaam aawadeed kuwanu waxay
reer Israa'iil ka dhigeen inay Rabbiga kaga xadgudbaan
xaalkii Fecoor, oo sidaas daraaddeed belaayadaa uga dhex
dhacday shirkii Rabbiga. **17** Haddaba sidaas daraaddeed
dila dhallaanka mid kastoo lab ah, oo dila naag kastoo nin
la seexatay. **18** Laakiinse carruurta dhaddig oo aan rag la
seexan daysta. **19** Oo idinna xerada dibaddeeda dega intii
toddoba maalmood ah. Oo ku alla kii qof dilay, iyo ku alla
kii qof la dilay taabtayba, maalinta saddexaad iyo maalinta
toddobaad ha isdaahiriyo, idinka iyo maxaabiistiinnuba. **20**
Oo waxaad kaloo daahirsataan dhar kasta iyo inta haragga
laga sameeyey oo dhan, iyo wax kasta oo dhogor riyaad ah,
iyo alaab kasta oo qoryo laga sameeyeyba. **21** Oo wadaadkii
Elecaasaar ahaana wuxuu ku yidhi raggii dagaalka u baxay,
Kanu waa qaynuunkii sharciga oo Rabbigu Muuse ku amray.
**22** Habase yeeshee dahabka, iyo lacagta, iyo naxaasta, iyo
birta, iyo waxa daasadda ah, iyo waxa rasaasta ah, **23** iyo
wax kasta oo dab u adkaysta waa inaad dab dhex marisaan,
oo markaas nadiif bay ahaan doonaan; hase ahaatee waa
in lagu daahiriyaa biyaha nijaasta daahiriya, oo wixii aan
dabka u adkaysanna waa inaad biyaha dhex marisaan. **24**
Oo dharkiinnana waa inaad maalinta toddobaad maydhaan,
oo markaas daahir baad ahaanaysaan oo kolkaas dabadeed
waa inaad xerada soo gashaan. **25** Markaasaa Rabbigu
Muuse la hadlay, oo wuxuu ku yidhi, **26** Soo tiriya boolida
la soo dhacay, dad iyo duunyaba, adiga iyo wadaadka
Elecaasaar ah iyo madaxda qabiilooyinka shirka, **27** oo
boolida laba meelood u kala qaybi, oo kala sii ragga
dagaalyahanka ah ee dagaalka u baxay, iyo intii kale ee
shirka oo dhan; **28** oo Rabbiga canshuur uga qaad raggii
dagaalka u baxay; oo shantii boqolba mid ka soo bixi dadka,
iyo lo'da, iyo dameerrada, iyo idaha, **29** badhkooda intaas
ka qaad, oo waxaad wadaadka Elecaasaar ah u siisaa
Rabbiga qurbaankiisa sare loo qaado. **30** Oo reer binu
Israa'iil badhkoodana kontonkiiba mid ka soo bixi dadka,
iyo lo'da, iyo dameerrada, iyo idaha, iyo xataa xoolaha
oo dhan, oo waxaad siisaa reer Laawi oo haya shuqulka
taambuugga Rabbiga. **31** Markaasaa Muuse iyo wadaadkii
Elecaasaar ahaa waxay sameeyeen sidii Rabbigu Muuse
ku amray. **32** Haddaba boolidii aan lagu tirin wixii nimankii
dagaalyahannada ahaa soo dhaceen waxay ahayd lix boqol
iyo shan iyo toddobaatan kun oo ido ah, **33** iyo laba iyo
toddobaatan kun oo lo' ah, **34** iyo kow iyo lixdan kun oo
dameer, **35** oo dadkuna kulligiis wuxuu ahaa laba iyo soddon
kun oo ah dumarkii aan rag la seexan. **36** Oo badhkii ahaa
kuwii dagaalka u baxay qaybtoodii waxay ahayd saddex
boqol iyo toddoba iyo soddon kun iyo shan boqol oo ido
ah. **37** Oo Rabbiga canshuurtiisii idaha ka go'day waxay
ahayd lix boqol iyo shan iyo toddobaatan neef. **38** Oo lo'duna
waxay ahayd lix iyo soddon kun, oo Rabbiga canshuurtiisii
ka go'dayna waxay ahayd laba iyo toddobaatan neef. **39**
Oo dameerraduna waxay ahaayeen soddon kun iyo shan
boqol, oo Rabbiga canshuurtiisii ka go'dayna waxay ahayd
kow iyo lixdan neef. **40** Oo dadkuna wuxuu ahaa lix iyo
toban kun, oo Rabbiga canshuurtiisii ka go'dayna waxay
ahayd laba iyo soddon qof. **41** Oo canshuurtii ahayd Rabbiga
qurbaankiisii sare loo qaado Muuse wuxuu siiyey wadaadkii
Elecaasaar ahaa, sidii Rabbigu Muuse ku amray. **42** Oo reer
binu Israa'iil badhkoodii wuxuu Muuse gooni uga dhigay
qaybtii raggii dagaallamay. **43** (Haddaba shirka badhkiisii
wuxuu ahaa saddex boqol iyo toddoba iyo soddon kun
iyo shan boqol oo ido ah, **44** iyo lix iyo soddon kun oo
lo' ah, **45** iyo soddon kun iyo shan boqol oo dameerro
ah, **46** iyo lix iyo toban kun oo qof.) **47** Oo xataa reer
binu Israa'iil badhkoodii Muuse kontonkiiba mid buu ka soo
saaray dad iyo duunyaba, oo wuxuu siiyey reer Laawi oo
haya shuqulkii taambuuggii Rabbiga, sidii Rabbigu Muuse
ku amray. **48** Markaas waxaa Muuse u yimid saraakiishii
ahayd kun-u-taliyayaashii iyo boqol-u-taliyayaashii oo u
sarreeyey kumanyaalkii ciidanka ahaa, **49** oo waxay Muuse
ku yidhaahdeen, Annagoo addoommadaada ah waan soo
tirinnay ragga dagaalyahannada ah oo aannu u talinno,
oo nin qudhuhu nagama dhinna. **50** Oo annagu waannu
keennay qurbaankii Rabbiga, kaas oo ah wixii dahab ah oo
nin waluba helay, kuwaasoo ah silsilado, iyo dugaagado, iyo
kaatunno, iyo hilqado, iyo murriyado, inaannu naftayada
Rabbiga hortiisa u kafaaro gudno. **51** Oo Muuse iyo wadaadkii
Elecaasaar ahaa iyagay ka qaadeen dahabkii oo ahaa wax
kasta oo laysku sharxo oo dahab laga sameeyey. **52** Oo
dahabkii qurbaanka sare loo qaado oo dhan oo ay kun-u-
taliyayaasha iyo boqol-u-taliyayaashu Rabbiga u bixiyeen
wuxuu ahaa lix iyo toban kun iyo toddoba boqol iyo konton
sheqel. **53** (Waayo, raggii dagaalyahannada ahaa nin waluba
wuxuu qaatay wixii uu soo dhacay.) **54** Markaasaa Muuse
iyo wadaadkii Elecaasaar ahaa dahabkii ka qaadeen kun-u-
taliyayaashii iyo boqol-u-taliyayaashii, oo waxay soo geliyeen
teendhadii shirka inuu reer binu Israa'iil Rabbiga hortiisa
xusuus ugu ahaado.

**32** Haddaba reer Ruubeen iyo reer Gaad waxay lahaayeen
xoolo faro badan, oo markay arkeen dalkii Yacser
iyo dalkii Gilecaad inay meeshaasu xoolo u wanaagsan
tahay, 2 ayay reer Gaad iyo reer Ruubeen u yimaadeen
Muuse iyo wadaadkii Elecaasaar ahaa iyo amiirradii shirka,
oo waxay ku yidhaahdeen, 3 Cataarood, iyo Diboon, iyo
Yacser, iyo Nimraah, iyo Xeshboon, iyo Elecaaleeh, iyo
Sebaam, iyo Neboo, iyo Becon, 4 oo ah dalkii Rabbigu
wax kaga dhuftay reer binu Israa'iil hortooda waa dal
xoolo u wanaagsan, oo annagoo addoommadaada ahuna
xoolo baannu leennahay. 5 Oo weliba waxay yidhaahdeen,
Haddaad raalli naga tihiin, annagoo addoommadaada ah
dalkan inaannu hantinno noo sii, oo Webi Urdun ha naga
gudbin. 6 Markaasaa Muuse wuxuu reer Gaad iyo reer
Ruubeen ku yidhi, War, walaalihiin ma dagaalkay galayaan
oo idinku aad iska fadhiisanaysaan? 7 Oo maxaad reer binu
Israa'iil uga qalbi jebinaysaan inay u gudbaan oo galaan
dalkii Rabbigu iyaga siiyey? 8 Aabbayaashiinna sidaasay
yeeleen markaan iyaga ka diray Qaadeesh Barneeca inay
dalka soo arkaan aawadeed. 9 Waayo, markay tageen
dooxadii Eshkol oo ay dalkii arkeen ayay reer binu Israa'iil
qalbi jebiyeen si ayan u gelin dalkii Rabbigu iyaga siiyey.
10 Maalintaas Rabbigu aad buu u cadhooday, oo intuu
dhaartay ayuu yidhi, 11 Hubaal dadkii Masar ka soo baxay
intii labaatan sannadood jirta ama ka sii weyn, midkoodna
ma arki doono dalkii aan ugu dhaartay Ibraahim, iyo Isxaaq,
iyo Yacquub, maxaa yeelay, qalbiga igama ay wada raacin,
12 Kaaleeb ina Yefunneh oo ahaa reer Qenes, iyo Yashuuca
ina Nuun mooyaane; maxaa yeelay, iyagu qalbigay Rabbiga
ka wada raaceen. 13 Markaasaa Rabbigu reer binu Israa'iil
u cadhooday, oo wuxuu iyagii ka dhigay inay intii afartan
sannadood ah cidlada hor iyo dib ugu warwareegaan, ilamaa
qarnigii Rabbiga hortiisa xumaanta ku sameeyey oo dhan
la wada baabbi'iyey. 14 Haddaba bal eega, idinku meeshii
aabbayaashiin baad ka kacdeen, oo waxaad tihiin niman
dembi miidhan ah oo soo kordhay inaad Rabbiga kaga sii
cadhaysiisaan reer binu Israa'iil. 15 Waayo, haddaad Rabbiga
ka noqotaan, cidlada dhexdeeda ayuu haddana iyaga kaga
tegi doonaa, oo dadkan oo dhan waad wada baabbi'in
doontaan. 16 Markaasay isagii u soo dhowaadeen, oo waxay
ku yidhaahdeen, Annagu halkanaannu xoolahayaga xeryo
uga oodaynaa, dhallaankayagana magaalooyin waannu uga
dhisaynaa, 17 laakiinse annaga qudhayadu diyaar baannu
ahaanaynaa annagoo hub leh, oo reer binu Israa'iil baannu
hor kacaynaa ilamaa aannu iyaga geeyno meeshoodii, oo
kuwa dhulka deggan aawadood dhallaankayagu waxay
deganaanayaan magaalooyinka deyrarka leh. 18 Oo annagu
guryahayaga ku soo noqon mayno ilamaa reer binu Israa'iil
nin waluba dhaxalkiisa dhaxlo. 19 Waayo, annagu iyaga la
dhaxli mayno Webi Urdun dhankiisa kale iyo xaggaas hore
toona, maxaa yeelay, dhaxalkayagii wuxuu noogu dhacay
Webi Urdun dhankiisan bari. 20 Kolkaasaa Muuse wuxuu
iyagii ku yidhi, Haddaad waxan samaynaysaan, oo aad
Rabbiga hortiisa hub ugu qaadanaysaan dagaalka, 21 oo aad
raggiinna hubka leh oo dhammu Webi Urdun ku dhaafaysaan
Rabbiga hortiisa ilamaa uu isagu cadaawayaashiisa ka wada
eryo hortiisa, 22 oo dalkana Rabbiga hortiisa lagaga adkaado,
markaas dabadeed idinku waad soo noqonaysaan, oo xagga
Rabbiga iyo reer binu Israa'iilba waad ka eedla'aanaysaan, oo
dalkanuna Rabbiga hortiisa hanti buu idiinku ahaan doonaa.
23 Laakiinse haddaydnan sidaas yeelin, bal eega, Rabbigaad
ku dembaabteen, oo bal ogaada, dembigiinnuna wuu idinku
soo bixi doonaa. 24 Haddaba dhallaankiinna magaalooyin u
dhista, idihiinnana xeryo u oota, oo sameeya wixii afkiinna
ka soo baxay. 25 Markaasaa reer Gaad iyo reer Ruubeen
la hadleen Muuse, oo waxay ku yidhaahdeen, Annagoo
addoommadaada ah waannu samaynaynaa wixii aad nagu
amartay, sayidkayagiiyow. 26 Haddaba dhallaankayaga, iyo
afooyinkayaga, iyo idahayaga, iyo xoolahayaga oo dhammu
halkaasay wada joogi doonaan xagga magaalooyinka
Gilecaad; 27 laakiinse annagoo addoommadaada ah kulli
intayada dagaalka hub u leh oo dhammu Webi Urdun waannu
gudbaynaa, oo Rabbiga hortiisa ayaannu ku dagaal galaynaa
sidaad tidhi, sayidkayagiiyow. 28 Sidaas daraaddeed ayaa
Muuse amar iyaga ku saabsan siiyey wadaadkii Elecaasaar
iyo Yashuuca ina Nuun iyo madaxdii reeraha qabiilooyinka
reer binu Israa'iil. 29 Oo Muuse wuxuu iyagii ku yidhi, Haddii
reer Gaad iyo reer Ruubeen Webi Urdun idinla gudbaan,
intooda Rabbiga hortiisa dagaalka hub u leh oo dhammu,
oo dalka lagaga adkaado hortiinna, markaas waa inaad
iyaga hanti u siisaan dalka Gilecaad. 30 Laakiinse haddayan
idinla gudbin iyagoo hub leh, waxay hanti ku yeelan doonaan
dhexdiinna dalka reer Kancaan. 31 Markaasaa reer Gaad iyo
reer Ruubeen u jawaabeen, oo waxay ku yidhaahdeen, Sidii
Rabbigu nagu yidhi, annagoo addoommadaada ah, ayaannu
yeelaynaa. 32 Annagoo hub leh ayaannu gudbaynaa oo
Rabbiga hortiisa waxaannu galaynaa dalka reer Kancaan, oo
hantidii aan dhaxalka u helnayna waxay noogu hadhaysaa
Webi Urdun dhinacan. 33 Markaasaa Muuse reer Gaad
iyo reer Ruubeen iyo qabiilkii reer Manaseh oo ahaa wiilkii
Yuusuf badhkood wuxuu siiyey boqorkii reer Amor oo ahaa
Siixon boqortooyadiisii, iyo boqorkii Baashaan oo ahaa
Coog boqortooyadiisii, oo wuxuu waddankii ugu qaybshay
sidii ay ahaayeen magaalooyinka iyo soohdintoodii, xataa

magaalooyinkii dalka iyaga ku wareegsan oo dhan. 34
Markaasaa reer Gaad waxay dhisteen Diboon, iyo Cataarood,
iyo Carooceer, 35 iyo Catrood Shoofaan, iyo Yacser, iyo
Yaagbehaah, 36 iyo Beytnimraah, iyo Beyd Haaraan,
kuwaasoo ah magaalooyin deyrar leh, iyo xeryo idaad. 37 Oo
reer Ruubeenna waxay dhisteen Xeshboon, iyo Elecaaleeh,
iyo Qiryaatayim, 38 iyo Neboo, iyo Bacal Mecoon, (kuwaasoo
magacyadoodii la beddelay, ) iyo Sibmaah; oo magacyo kalay
u bixiyeen magaalooyinkii ay dhisteen. 39 Oo reer Maakiir oo
ahaa Manaseh wiilkiisiina waxay tageen dalkii Gilecaad, oo
way qabsadeen, oo dadkii reer Amor oo halkaas degganaa
ayay hanti tireen. 40 Oo Muuse wuxuu Gilecaad siiyey reer
Maakiir oo ahaa wiilkii Manaseh, oo iyana halkaasay degeen.
41 Oo reer Yaa'iir ina Manasehna wuu tegey Gilecaad, oo
magaalooyinkeedii qabsaday, oo wuxuu magacyadoodii
u bixiyey Hawood Yaa'iir. 42 Oo Nobaxna wuu tegey oo
wuxuu qabsaday Qenaad iyo tuulooyinkeediiba, markaasuu
u bixiyey magiciisa Nobax.

**33** Reer binu Israa'iil sodcaalladoodii waa kuwan markay
gacanta Muuse iyo Haaruun koox koox ugaga soo
bexeen dalkii Masar. 2 Oo Muuse wuxuu amarka Rabbiga
ugu qoray bixitimmadoodii sidii sodcaalladoodu ahaayeen,
oo sodcaalladoodii sidii bixitimmadoodu ahaayeen waa
kuwan. 3 Oo bishii kowaad maalinteedii shan iyo tobnaad
ayay Racmeses ka guureen. Habeenkii Kormaridda maalintii
ka dambaysay ayay reer binu Israa'iil gacan sarraysa ku
bexeen iyadoo Masriyiintii oo dhammu ay u jeedaan, 4 intii
Masriyiintu ay aasayeen curadyadoodii uu Rabbigu ku dhex
laayay oo dhan. Oo ilaahyadoodiina Rabbigu xukummo buu
ku soo dejiyey. 5 Oo reer binu Israa'iil Racmeses bay ka
guureen, oo waxay degeen Sukod. 6 Oo Sukodna way
ka guureen, oo waxay degeen Eetaam oo ku taal cidlada
darafkeeda. 7 Oo haddana Eetaam bay ka guureen, oo
waxay dib ugu noqdeen Fiihaahiirod oo ku hor taal Bacal
Sefoon; kolkaasay degeen Migdol horteeda. 8 Oo Haxiirod
horteedana way ka guureen, oo badday dhex mareen oo
waxay gaadheen cidlada, oo cidladii Eetaam ayay saddex
maalmood socodkood ku dhex socdeen, kolkaasay Maaraah
degeen. 9 Oo Maaraahna way ka guureen, oo waxay
yimaadeen Eelim, oo Eelim waxaa ku yiil laba iyo toban
ilood oo biyo ah iyo toddobaatan geed oo timir ah, kolkaasay
halkaas degeen. 10 Oo haddana Eelim way ka guureen,
oo waxay degeen Badda Cas agteeda. 11 Oo Badda Cas
way ka guureen, oo waxay dhex degeen cidlada Siin la
yidhaahdo. 12 Oo cidladii Siinna way ka guureen, kolkaasay
degeen Daafqaah. 13 Oo Daafqaahna way ka guureen, oo
waxay degeen Aaluush. 14 Oo Aaluushna way ka guureen,
oo waxay degeen Refiidiim, meeshaas oo aan lahayn biyo
ay dadku cabbaan. 15 Oo Refiidiimna way ka guureen, oo
waxay dhex degeen cidladii Siinay. 16 Oo cidladii Siinayna
way ka guureen, kolkaasay degeen Qibrood Xatawaah. 17
Oo Qibrood Xatawaahna way ka guureen, kolkaasay degeen
Xaseerood. 18 Oo Xaseeroodna way ka guureen, oo waxay
degeen Ritmaah. 19 Oo Ritmaahna way ka guureen, oo
waxay degeen Rimmon Feres. 20 Oo Rimmon Feresna way
ka guureen, oo waxay degeen Libnaah. 21 Oo Libnaahna
way ka guureen, oo waxay degeen Risaah. 22 Oo Risaahna
way ka guureen, oo waxay degeen Qeheelaataah. 23 Oo
Qeheelaataahna way ka guureen, oo waxay degeen Buur
Shefer. 24 Oo haddana Buur Shefer way ka guureen, oo
waxay degeen Xaraadaah. 25 Oo Xaraadaahna way ka
guureen, oo waxay degeen Maqheelod. 26 Oo Maqheelodna
way ka guureen, oo waxay degeen Taxad. 27 Oo Taxadna
way ka guureen, oo waxay degeen Terax. 28 Oo Teraxna way
ka guureen, oo waxay degeen Mitqaah. 29 Oo Mitqaahna
way ka guureen, oo waxay degeen Xashmonaah. 30
Oo Xashmonaahna way ka guureen, oo waxay degeen
Mooseerood. 31 Oo Mooseeroodna way ka guureen, oo
waxay degeen Bini Yacaqaan. 32 Oo Bini Yacaqaanna
way ka guureen, oo waxay degeen Xor Haggidgaad. 33
Oo Xor Haggidgaadna way ka guureen, oo waxay degeen
Yaatbaataah. 34 Oo haddana Yaatbaataah way ka guureen,
oo waxay degeen Cabronaah. 35 Oo Cabronaahna way ka
guureen, oo waxay degeen Cesyoon Geber. 36 Oo Cesyoon
Geberna way ka guureen, oo waxay degeen cidladii Sin
(taasoo ah Qaadeesh). 37 Oo Qaadeeshna way ka guureen,
oo waxay degeen Buur Xor oo ku taal dalka reer Edom
darafkiisa. 38 Markaasaa wadaadkii Haaruun ahaa wuxuu
Buur Xor ku fuulay amarka Rabbiga, oo halkaasuu ku
dhintay sannaddii afartanaad bishii shanaad maalinteedii
kowaad markay reer binu Israa'iil dalkii Masar ka soo bexeen
dabadeed. 39 Haaruunna markuu Buur Xor ku dhintay
wuxuu jiray boqol iyo saddex iyo labaatan sannadood. 40 Oo
boqorkii Caraad oo reer Kancaan ahaa oo degganaa xagga
koonfureed ee dalka reer Kancaan wuxuu maqlay in reer
binu Israa'iil soo socdaan. 41 Oo waxay ka guureen Buur Xor,
kolkaasay degeen Salmonaah. 42 Oo Salmonaahna way ka
guureen, oo waxay degeen Fuunon. 43 Oo Fuunonna way
ka guureen, oo waxay degeen Obod. 44 Oo Obodna way ka
guureen, oo waxay degeen Ciyee Hacabaariim, oo ku taal
soohdinta dalka Moo'aab. 45 Oo Ciyiimna way ka guureen,
oo waxay degeen Diibon Gaad. 46 Oo Diibon Gaadna way
ka guureen, oo waxay degeen Calmoon Diblaatayimaah. 47

Oo Calmoon Diblaatayimaahna way ka guureen, oo waxay
degeen buuraha Cabaariim oo Neboo ku hor yaal. 48 Oo
haddana buurihii Cabaariim way ka guureen, oo waxay
degeen bannaanka dalka Moo'aab oo Webi Urdun u dhow
ee Yerixoo ka soo hor jeeda. 49 Oo haddana waxay degeen
Webi Urdun agtiisa tan iyo Beytyeshimood iyo xataa tan iyo
Aabeel Shitiim oo ku yaal bannaanka dalka Moo'aab. 50
Markaasaa Rabbigu Muuse kula hadlay bannaankii dalka
Moo'aab oo Webi Urdun u dhowaa ee Yerixoo ka soo
hor jeeday, oo wuxuu ku yidhi, 51 Reer binu Israa'iil la
hadal, oo waxaad ku tidhaahdaa, Markaad Webi Urdun
gudubtaan oo aad dalka Kancaan gashaan, 52 waa inaad
dadka dalka deggan oo dhan hortiinna ka eridaan, oo aad
dhagaxyadooda sawirrada ah oo dhan wada baabbi'isaan,
oo aad sanamyadooda la shubay oo dhan wada burburisaan,
oo aad meelahooda sarsare oo dhan wada dumisaan. 53
Markaas waa inaad dalka hanti ahaan u qaadataan oo aad
iska dhex degtaan; waayo, dalka idinkaan idin siiyey inaad
lahaataan. 54 Oo dalka waa inaad qabiil qabiil saami ugu
dhaxashaan. Inta badan waxaad siisaan dhaxalka badan,
oo inta yarna waxaad siisaan dhaxalka yar. Oo meel alla
meeshii nin saami ugu dhaco halkaas isagaa iska lahaanaya,
oo sida qabiilooyinkii awowayaashiin yihiin waa inaad u
dhaxashaan. 55 Laakiinse haddaydnan dadka dalka deggan
hortiinna ka eryin, markaas kuwii aad daysaan waxay idinku
noqon doonaan sidii wax indhihiinna muda, iyo sidii qodxan
dhinacyada idinkaga jira, oo waxay idinku dhibi doonaan
dalka aad deggan tihiin. 56 Oo sidii aan ku talaggalay inaan
iyaga ku sameeyo ayaan idinka idinku samayn doonaa.

**34** Markaasaa Rabbigu Muuse la hadlay, oo wuxuu
ku yidhi, 2 Reer binu Israa'iil waxaad ku amartaa
oo ku tidhaahdaa, Markaad gashaan dalka Kancaan,
(kaas oo ah dalka dhaxal idiinku dhici doona oo ah
dalka Kancaan siday soohdimihiisu yihiin, ) 3 waaxdiinna
koonfureed waxay ahaan doontaa cidlada Sin iyo tan iyo
dhinaca Edom, oo soohdintiinna koonfureedna waxay ka
bilaaban doontaa Badda Cusbada leh darafkeeda bari, 4
oo soohdintiinnuna waxay la soo wareegi doontaa xagga
koonfureed oo jiirtii Caqrabbiim, oo waxay u gudbi doontaa
ilamaa Sin, oo dhammaadkeeduna wuxuu ahaan doonaa
Qaadeesh Barneeca xaggeeda koonfureed, oo waxay u sii
bixi doontaa xagga Hasar Addaar, oo waxay u sii dhaafi
doontaa ilaa Casmoon. 5 Oo soohdintu waxay la soo
wareegi doontaa Casmoon ilaa tan iyo durdurka Masar, oo
dhammaadkeeduna wuxuu ahaan doonaa xagga badda. 6
Oo soohdinta galbeedna waxaad yeelan doontaan badda
weyn iyo soohdinteedaba. Intaasu waxay ahaan doontaa
soohdintiinna galbeed. 7 Oo intanuna waxay ahaan doontaa
soohdintiinna woqooyi, waxaad ka tilmaansataan badda
weyn ilaa tan iyo Buur Xor. 8 Oo Buur Xorna waxaad
ka tilmaansataan ilaa tan iyo meesha Hamaad laga galo,
oo soohdinta dhammaadkeeduna wuxuu ahaan doonaa
Sedaad. 9 Oo soohdintu waxay u bixi doontaa xagga Sifron,
oo dhammaadkeeduna wuxuu ahaan doonaa Hasar Eenaan.
Taasu waxay ahaan doontaa soohdintiinna woqooyi. 10 Oo
soohdintiinna barina waxaad ka tilmaansataan Hasar Eenaan
ilamaa tan iyo Shefaam. 11 Oo soohdintu waxay hoos uga
dhaadhici doontaa Shefaam iyo ilamaa Riblaah oo ah Cayn
xaggeeda bari, oo soohdintu waxay hoos ugu dhaadhici
doontaa oo gaadhi doontaa badda Kinnered dhinaceeda
bari. 12 Oo soohdintu waxay hoos ugu dhaadhici doontaa
Webi Urdun oo dhammaadkeeduna wuxuu ahaan doonaa
Badda Cusbada leh. Intaasu waxay ahaan doontaa dalkiinna
siday soohdimihiisu u wareegsan yihiin. 13 Markaasaa
Muuse amray reer binu Israa'iil, oo wuxuu ku yidhi, Waa
kan dalka aad saamiga ku dhaxli doontaan oo Rabbigu
amray in la siiyo sagaalka qabiil iyo qabiilka badhkiis,
14 waayo, qabiilkii Ruubeen sida reerahoodu yihiin, iyo
qabiilkii Gaad sida reerahoodu yihiin, iyo qabiilkii Manaseh
badhkiis horay u heleen dhaxalkoodii. 15 Labadaas qabiil
iyo qabiilka badhkiis waxay dhaxalkoodii u heleen Webi
Urdun shishadiisa, ee Yerixoo barigeeda ah, xagga qorrax
ka soo baxa. 16 Markaasaa Rabbigu Muuse la hadlay, oo
wuxuu ku yidhi, 17 Nimanka dalka dhaxal idiinku qaybin
doonaa magacyadoodii waa kuwan: wadaadka Elecaasaar
ah iyo Yashuuca ina Nuun. 18 Oo qabiil kastana waa inaad
amiir kala soo baxdaan inay dalka dhaxal u kala qaybiyaan.
19 Oo nimankaas magacyadoodiina waa kuwan: qabiilka
reer Yahuudah kala soo baxa Kaaleeb ina Yefunneh. 20
Qabiilka reer Simecoonna, Shemuu'eel ina Cammiihuud.
21 Qabiilka reer Benyaamiinna, Eliidaad ina Kisloon. 22
Qabiilka reer Daanna waxaad kala baxdaan amiir, kaas oo ah
Buqii ina Yaaglii. 23 Reer Yuusufna, qabiilka reer Manaseh
waxaad kala soo baxdaan amiir, kaas oo ah Xannii'eel ina
Eefod. 24 Qabiilka reer Efrayimna waxaad kala soo baxdaan
amiir, kaas oo ah Qemuu'eel ina Shiftaan. 25 Qabiilka
reer Sebulunna waxaad kala baxdaan amiir, kaas oo ah
Eliisaafaan ina Farnaag. 26 Qabiilka reer Isaakaarna waxaad
kala soo baxdaan amiir, kaas oo ah Faltii'eel ina Casaan. 27
Qabiilka reer Aasheerna waxaad kala soo baxdaan amiir,
kaas oo ah Axiihuud ina Shelomii. 28 Qabiilka Naftaalina
waxaad kala soo baxdaan amiir, kaas oo ah Fedaheel ina

Cammiihuud. **29** Kuwaasu waa inta Rabbigu ku amray inay reer binu Israa'iil dhaxalka ugu qaybiyaan dalka Kancaan.

**35** Markaasaa Rabbigu Muuse kula hadlay bannaankii Moo'aab oo Webi Urdun u dhowaa ee Yerixoo ka soo hor jeeday, oo wuxuu ku yidhi, **2** Waxaad reer binu Israa'iil ku amartaa inay dhaxalkooda hantida ah reer Laawi ka siiyaan magaalooyin ay degaan, oo magaalooyinkaas agagaarkooda ku wareegsanna reer Laawi siiya. **3** Oo magaalooyinka iyagaa lahaanayaan inay degaan, agagaarkooduna waxay u ahaan doonaan lo'dooda, iyo alaabtooda, iyo xoolahooda oo dhan. **4** Oo magaalooyinka aad reer Laawi siin doontaan agagaarkooda ha laga bilaabo magaalo kasta derbigeeda, oo dibadda ha uga baxo kun dhudhun oo hareeraheeda ku wareegsan ah. **5** Oo magaalada dibaddeeda waa inaad ka qiyaastaan xagga bari laba kun oo dhudhun, dhanka koonfureedna waa inaad ka qiyaastaan laba kun oo dhudhun, dhanka galbeedna waa inaad ka qiyaastaan laba kun oo dhudhun, dhanka woqooyina waa inaad ka qiyaastaan laba kun oo dhudhun, oo magaaladuna dhexda ha ahaato. Oo intaasaa iyaga u ahaan doonta agagaarka magaalooyinka. **6** Oo magaalooyinka aad reer Laawi siin doontaan waxay ahaan doonaan lixda magaalo oo magangalka ah oo aad siin doontaan si uu gacankudhiigluhu ugu cararo, oo kuwaas mooyaane waxaad kaloo iyaga siisaan laba iyo afartan magaalo. **7** Oo magaalooyinka aad reer Laawi siin doontaan oo dhammu waxay ahaan doonaan siddeed iyo afartan magaalo, oo waxaad siin doontaan iyaga iyo agagaarkoodaba. **8** Oo waxa ku saabsan magaalooyinka aad reer Laawi hantida uga siin doontaan reer binu Israa'iil waa sidan, waa inaad kuwii badan magaalooyin badan ka qaaddaan, kuwii yarna waa inaad magaalooyin yar ka qaaddaan, oo mid waluba dhaxalkiisii uu dhaxlay magaalooyinkiisa reer Laawi wax ha ka siiyo. **9** Markaasaa Rabbigu Muuse la hadlay, oo wuxuu ku yidhi, **10** Reer binu Israa'iil la hadal, oo waxaad ku tidhaahdaa, Markaad Webi Urdun dhaaftaan oo aad gashaan dalka Kancaan, **11** waa inaad doorataan magaalooyin idiin ahaada magaalooyin aad magan gashaan, si uu gacankudhiigluhu qof kama' u dilaa halkaas ugu cararo. **12** Oo magaalooyinkaasu waxay idiin ahaan doonaan meel aad ka magan gashaan kan aardoonka ah, si uusan gacankudhiigluhu u dhiman intuusan shirka hortiisa xukun isu soo taagin. **13** Oo magaalooyinka aad bixin doontaan waxay idiin ahaan doonaan lix magaalo oo magangal ah. **14** Oo Webi Urdun shishadiisa waa inaad ka bixisaan saddex magaalo, dalka Kancaanna waa inaad ka bixisaan saddex magaalo, oo iyagu waa inay ahaadaan magaalooyin magangal ah. **15** Oo lixdaas magaalo waxaa magangeli doona reer binu Israa'iil iyo shisheeyaha iyo qariibka iyaga dhex deggan, si uu ku alla kii qof kama' u dilaa ugu cararo. **16** Laakiinse hadduu wax bir ah ku dhufto, oo uu sidaas ku dhinto, markaas isagu waa gacankudhiigle, oo gacankudhiiglaha hubaal waa in la dilaa. **17** Oo hadduu ku dhufto dhagax uu gacanta ku haysto oo qof u dhiman karo, oo uu sidaas ku dhinto, markaas isagu waa gacankudhiigle, oo gacankudhiiglaha hubaal waa in la dilaa. **18** Amase hadduu ku dhufto hub qori ah oo uu gacanta ku haysto oo qof u dhiman karo, oo uu sidaas ku dhinto, markaas isagu waa gacankudhiigle, oo gacankudhiiglaha hubaal waa in la dilaa. **19** Oo aardoonka dhiigga doonayaa qudhiisu ha dilo gacankudhiiglaha. Markuu isaga helo ha dilo. **20** Oo hadduu nacayb aawadiis u riixdo, ama intuu u gabbado uu wax ku tuuro, oo uu markaas dhinto, **21** amase hadduu cadownimo aawadeed gacanta ugu dhufto, oo uu sidaas ku dhinto, kii wax ku dhuftay hubaal waa in la dilaa, waayo, isagu waa gacankudhiigle, oo aardoonka dhiigga doonayaa gacankudhiiglaha ha dilo markuu helo. **22** Laakiinse hadduu kama' u riixo isagoo aan cadownimo ku jirin, amase uu wax ku tuuro isagoo aan u gabban, **23** amase hadduu ku dhufto dhagax qof u dhiman karo, oo isagoo aan arkayn uu ku tuuro, oo uu sidaas ku dhinto, oo hadduusan cadowgiis ahayn ama uusan waxyeelladiisa doondoonayn, **24** markaas kii wax dilay iyo kan ah aardoonka dhiigga doonayo, shirku waa inuu ugu kala garsooraa sida xukummadanu yihiin. **25** Oo shirku waa inuu gacankudhiiglaha ka samatabbixiyaa gacanta kan ah aardoonka dhiigga doonayo, oo shirku waa inuu isaga ku celiyaa magaaladiisii uu magangalay, oo uu ku cararay, oo isagu waa inuu halkaas degganaado jeer uu dhinto wadaadka sare oo lagu subkay saliiddii quduuska ahayd. **26** Laakiinse gacankudhiigluhu mar kasta ha ahaatee hadduu ka gudbo soohdinta magaaladiisii uu magangalay oo uu ku cararay, **27** oo markaas kii ahaa aardoonka dhiigga doonayo uu ka helo meel dibadda ka ah soohdinta magaaladiisii uu magangalay, kolkaas kii ahaa aardoonka dhiigga doonayo hadduu gacankudhiiglaha dilo, isagu ma ahaan doono mid dhiig qaba, **28** waayo, waxaa isaga waajib ku ahaa inuu iska joogo magaaladiisii uu magangalay ilamaa uu wadaadka sare dhinto, laakiinse markuu wadaadka sare dhinto gacankudhiigluhu waa inuu markaas dabadeed ku noqdo dalkiisii hantida u ahaa. **29** Oo waxyaalahanu waa inay qaynuun xukun ah degmooyinkiinna oo dhan idiinku ahaadaan ab ka abkiin. **30** Ku alla kii qof dila, gacankudhiiglaha waa in la dilaa markii lagu marag furo, laakiinse qofnaba yaan lagu dilin markhaati keliya

maragfurkiis. 31 Oo weliba waa inaydaan innaba furan nafta
gacankudhiigle dhimasho lagu xukumay, laakiinse hubaal
waa in la dilaa. 32 Oo weliba waa inaydaan furan kii ku
cararay magaaladiisa magangalka ah, si uu ugu noqdo oo
uu u dego dalkiisa ilamaa uu wadaadka sare dhinto. 33
Dalka aad deggan tihiin waa inaydaan nijaasayn, waayo,
dhiigu dalka waa nijaaseeyaa, oo dalka dhiiggii lagu dhex
daadshay wax loogu kafaaro gudi karo lama arko, dhiigga kii
daadshay mooyaane. 34 Oo waa inaydaan nijaasayn dalka
aad dhex deggan tihiin, oo anna aan dhexdiisa degganahay,
waayo, aniga Rabbiga ahu waxaan dhex degganahay reer
binu Israa'iil.

**36** Markaas madaxdii qabiilka reer Gilecaad oo ahaa ina
Maakiir, ina Manaseh oo ka mid ahaa qabiilooyinkii
ilma Yuusuf way soo dhowaadeen, oo waxay ku hor hadleen
Muuse iyo amiirradii ahaa madaxdii qolooyinka reer binu
Israa'iil, 2 oo waxay yidhaahdeen, Sayidkayagiiyow, Rabbigu
wuxuu kugu amray inaad reer binu Israa'iil dalka dhaxal
ahaan saami ugu kala qaybiso, oo weliba, sayidkayagiiyow,
waxaa Rabbigu kugu amray inaad walaalkayo Selaafexaad
gabdhihiisa dhaxalka siiso. 3 Oo hadday guursadaan wiilasha
qabiilooyinka kale oo reer binu Israa'iil, markaas dhaxalkoodii
waa laga gooynayaa dhaxalka awowayaashayo, oo waxaa
lagu dari doonaa dhaxalka qabiilka ay ka guursadeen, oo
sidaasaa looga qaadan doonaa qaybtii dhaxalkayaga. 4
Oo markii reer binu Israa'iil ay gaadhaan sannaddii Yubilii,
ayaa dhaxalkooda lagu dari doonaa dhaxalka qabiilka ay ka
guursadeen, oo sidaasaa dhaxalkooda looga qaadi doonaa
dhaxalka qabiilka awowayaashayo. 5 Markaasaa Muuse
reer binu Israa'iil ku amray sidii uu eraygii Rabbigu ahaa,
oo wuxuu ku yidhi, Qabiilka ilma Yuusuf wax qumman
bay ku hadleen. 6 Waxyaalaha ku saabsan Selaafexaad
gabdhihiisa oo Rabbigu amray waa kuwan, oo wuxuu yidhi,
Iyagu ha guursadeen kii la wanaagsan iyaga, laakiinse
qabiilka aabbahood uun ha ka guursadeen. 7 Sidaasaanu
dhaxalka reer binu Israa'iil qabiil uga tagayn oo qabiil kale
ugu dhaafayn, waayo, reer binu Israa'iil nin waluba waa
inuu sii xajiyaa dhaxalkii qabiilka awowayaashiis. 8 Oo
gabadh kasta oo dhaxal ku leh qabiilooyinka reer binu
Israa'iil middood waa inay afo u ahaato mid ka mid ah qolada
qabiilka aabbaheed, si reer binu Israa'iil nin waluba u lahaado
dhaxalkii awowayaashiis. 9 Sidaasaanu dhaxalna qabiil uga
tagayn oo qabiil kale ugu dhaafayn, waayo, qabiilooyinka
reer binu Israa'iil mid waluba waa inuu dhaxalkiisa sii xajiyaa.
10 Oo sidii Rabbigu Muuse ku amray ayay Selaafexaad
gabdhihiisu yeeleen, 11 waayo, Maxlaah, iyo Tirsaah, iyo
Xoglaah, iyo Milkaah, iyo Nocaah, oo ahaa Selaafexaad
gabdhihiisii, waxay wada guursadeen ilma-adeerradood. 12
Oo waxay ka guursadeen qabiilooyinkii ilma Manaseh oo
ahaa ina Yuusuf, oo dhaxalkoodii wuxuu ku hadhay qabiilkii
reerka aabbahood. 13 Intaasu waa amarradii iyo xukummadii
uu Rabbigu u soo dhiibay Muuse oo uu ku amray reer binu
Israa'iil oo jooga bannaankii Moo'aab oo Webi Urdun u
dhowaa ee Yerixoo ka soo hor jeeday.

# Sharciga Kunoqoshadiisa

1 Kuwanu waa erayadii Muuse kula hadlay reer binu
Israa'iil markay joogeen Webi Urdun shishadiisa cidlada
dhexdeeda, oo ah Caraabaah oo ka soo hor jeedda Suuf,
meel u dhexaysa Faaraan, iyo Tofel, iyo Laabaan, iyo
Xaseerood, iyo Diisaahaab. 2 Oo koob iyo toban maalmood
ayaa looga socdaa Xoreeb xagga Buur Seciir ilaa tan iyo
Qaadeesh Barneeca. 3 Oo sannaddii afartanaad bisheedii
koob iyo tobnaad, maalinteedii kowaad ayaa Muuse reer
binu Israa'iil kula hadlay kulli amarradii Rabbigu ugu soo
dhiibay oo dhan. 4 Taasuna waa ka dambaysay diliddii
uu dilay Siixon oo ahaa boqorkii reer Amor oo degganaa
Xeshboon, iyo Coog oo ahaa boqorkii reer Baashaan oo
degganaa Cashtarod ee Edrecii ku taal. 5 Oo meeshaas ee
Webi Urdun ka shishaysa oo ku taal dalka reer Moo'aab
ayaa Muuse ka bilaabay inuu caddeeyo sharcigan, oo wuxuu
yidhi, 6 Rabbiga Ilaaheenna ahu wuxuu inala hadlay intaan
Xoreeb joognay oo wuxuu inagu yidhi, Buurtan in idinku filan
waad degganaydeen, 7 haddaba noqda oo guura oo waxaad
tagtaan dalka buuraha leh oo reer Amor, iyo meelaha halkaas
u dhow oo dhan oo ah Caraabaah, iyo dalka buuraha leh, iyo
dooxooyinka, iyo xagga koonfureed, iyo badda xeebteeda,
kuwaasoo ah dalka reer Kancaan, iyo Lubnaan, iyo tan iyo
webiga weyn oo Yufraad. 8 Bal eega, dalka waan idin hor
dhigay, haddaba gala oo hantiya dalkii Rabbigu ugu dhaartay
awowayaashiin oo ahaa Ibraahim iyo Isxaaq iyo Yacquub
inuu siinayo iyaga iyo farcankooda ka dambeeyaba 9 Oo
anna markaas waan idinla hadlay oo waxaan idhi, Anigu
idinma aan qaadi karo keli ahaantay. 10 Rabbiga Ilaahiinna
ahu wuu idin tarmiyey, oo bal eega, maanta waxaad u faro
badan tihiin sida xiddigaha samada oo kale. 11 Oo weliba
Rabbiga ah Ilaaha awowayaashiin ha idinka dhigo kun jeer in
ka sii badan intaad haatan tihiin, oo ha idiin barakeeyo siduu
idin ballanqaaday! 12 Oo bal anigoo keligay ah sidee baan u
qaadi karaa culayskiinna iyo rarkiinna iyo rabshaddiinna?
13 Haddaba siday qabiilooyinkiinnu yihiin waxaad kala soo
baxdaan rag xigmad leh oo waxgarad ah oo caan ah, oo
anna waxaan iyaga ka dhigayaa madax idiin talisa. 14 Oo
idinna waad ii jawaabteen oo waxaad igu tidhaahdeen,
Waxaad ku hadashay waa noo wanaagsan yihiin inaannu
samayno. 15 Sidaas daraaddeed waxaan soo kaxaystay
madaxdii qabiilooyinkiinna oo ah rag xigmad leh oo caan
ah, oo waxaan ka dhigay madax idiin talisa, oo ah kun u
taliyayaal, iyo boqol-u-taliyayaal, iyo konton-u-taliyayaal,
iyo toban u taliyayaal, iyo saraakiil, siday qabiilooyinkiinnu
ahaayeen. 16 Oo waagaas ayaan xaakinnadiinna amray,
oo waxaan ku idhi, Maqla dacwadaha walaalihiin dhex
yaal, oo caddaalad ugu kala garsoora nin iyo walaalkiis iyo
shisheeyaha isaga la jira. 17 Oo xagga garsooridda dadka
ha u kala eexanina. Kii yar iyo kii weynba waa inaad isku si
u maqashaan, oo ninna wejigiisa ha ka cabsanina, waayo,
garsooridda Ilaah baa iska leh, oo dacwaddii idinku adagna
ii keena, oo anna taas waan maqli doonaa. 18 Oo waagaas
waxaan idinku amray wixii aad samayn lahaydeen oo dhan.
19 Markaasaynu ka soo guurnay Xoreeb oo waxaynu dhex
marnay cidladaas weyn oo aad looga cabsado ee aad soo
aragteen ee ku taal jidka loo maro dalka buuraha leh oo
reer Amor, siduu inagu amray Rabbiga Ilaaheenna ahu, oo
waxaynu nimid Qaadeesh Barneeca. 20 Oo anna markaas
waxaan idinku idhi, War waxaad timaadeen dalka buuraha
leh oo reer Amor ee Rabbiga Ilaaheenna ahu ina siinayo. 21
Bal eega, Rabbiga Ilaahiinna ahu dalkii buu idin hor dhigay.
Haddaba u kaca, oo hanti u qaata sidii Rabbiga ah Ilaaha
awowayaashiin uu idiin sheegay, oo ha cabsanina, hana
qalbi jabina. 22 Oo mid kastoo idinka mid ahuba wuu ii soo
dhowaaday oo wuxuu igu yidhi, War aynu niman iska hor
marinno, si ay dalka inoogu soo baadhaan, oo ay inoogu
soo sheegaan jidka aan marayno iyo magaalooyinka aan
tegayno. 23 Oo anna taas aad baan ugu farxay, markaasaan
idinkala soo baxay laba iyo toban nin, oo qabiil kastaba
nin baan ka soocay. 24 Kolkaasay noqdeen oo buurtii u
kaceen, oo waxay gaadheen dooxadii Eshkol, wayna soo
basaaseen. 25 Oo waxay gacmahooda ku soo qaadeen
dalka midhihiisii, oo innagay inoo keeneen, oo haddana
intay inoo war keeneen ayay yidhaahdeen, Dalku waa
dal wanaagsan oo Rabbiga Ilaaheenna ahu ina siinayo.
26 Laakiinse idinku waad diiddeen inaad u kacdaan, oo
waxaad ku caasiyowdeen amarkii Rabbiga Ilaahiinna ah.
27 Oo teendhooyinkiinna ayaad ku dhex gunuunacdeen,
oo waxaad tidhaahdeen, Rabbigu nacaybka uu inoo qabo
aawadiis ayuu dalkii Masar inooga soo bixiyey inuu ina
geliyo gacanta reer Amor oo ay ina baabbi'iyaan. 28 Bal
xaggee baynu u sii kacnaa? Waayo, walaalaheen ayaa
qalbigeennii aad u cabsiiyey, oo waxay yidhaahdeen, Dadku
waa inaga badan yahay, wayna inaga dhaadheer yihiin, oo
magaalooyinkuna way waaweyn yihiin oo deyr samada ku
tolan ayaa ku wareegsan, oo weliba waxaan kaloo halkaas
ku soo aragnay reer Canaaq. 29 Oo markaasaan idinku
idhi, Ha cabsanina, hana ka baqina. 30 Waayo, waxaa
idiin dagaallami doona Rabbiga Ilaahiinna ah ee idin hor
socda, si waafaqsan kulli wixii uu indhihiinna hortooda

idiinku sameeyey dalkii Masar, 31 iyo cidladii oo aad ku soo
aragteen sidii Rabbiga Ilaahiinna ahu, sida nin wiilkiisa u
sido, uu idiinku siday jidkii aad soo marteen oo dhan ilamaa
aad meeshan timaadeen. 32 Oo weliba waxyaalahaas kuma
aydaan rumaysan Rabbiga Ilaahiinna ah 33 oo jidkii aad soo
marteen idinku soo hor kacay si uu idiinku doondoono meel
aad teendhooyinkiinna ka dhisataan, isagoo habeenkii dab
ku dhex jira, maalintiina daruur, si uu idiin tuso jidka aad mari
lahaydeen. 34 Oo Rabbigu wuu maqlay codkii erayadiinna,
markaasuu cadhooday oo intuu dhaartay ayuu yidhi, 35
Hubaal dadka qarnigan sharka ah midkoodna ma arki doono
dalka wanaagsan oo aan ku dhaartay inaan awowayaashiin
siinayo, 36 Kaaleeb ina Yefunneh mooyaane; isagu wuu
arki doonaa, oo waxaan dhulkii uu cag mariyey siin doonaa
isaga iyo carruurtiisaba, maxaa yeelay, isagu dhammaan
ahaanba ayuu Rabbiga u raacay. 37 Oo weliba Rabbigu
wuu ii cadhooday idinka aawadiin oo wuxuu yidhi, Adiguna
halkaas geli maysid. 38 Yashuuca ina Nuun oo hortaada
taagan ayaa halkaas geli doona. Isaga dhiirrigeli, waayo, reer
binu Israa'iil ayuu dalkaas dhaxalsiin doonaa. 39 Oo weliba
yaryarkiinna, oo aad tidhaahdeen, Waa la dhacayaa, iyo
carruurtiinna maanta aan khayr iyo shar kala aqoon, iyagu
dalkaas way geli doonaan, oo iyagaan siin doonaa, iyana
way hantiyi doonaan. 40 Laakiinse idinku noqda oo u guura
cidladii xagga jidka Badda Cas loo maro. 41 Markaasaad
jawaabteen oo waxaad igu tidhaahdeen, Rabbiga waannu
ku dembaabnay, haddaba waannu tegaynaa oo waxaannu
u dagaallamaynaa sidii Rabbiga Ilaahayaga ahu nagu
amray. Oo midkiin waluba wuxuu dhexda ku xidhay hubkiisii
dagaalka, oo waxaad mooddeen inay fudud dahay inaad
buurta u kacdaan. 42 Markaasaa Rabbigu igu yidhi, Waxaad
iyaga ku tidhaahdaa, Kor ha u kicina, hana dagaallamina,
waayo, anigu idinkuma dhex jiro, haddii kalese waxaa
laydinku layn doonaa cadaawayaashiinna hortooda. 43 Oo
sidaasaan idinkula hadlay, laakiinse ima aydaan maqlin,
illowse amarkii Rabbiga ayaad ku caasiyowdeen, waadna
kibirteen oo buurtaad u kacdeen. 44 Oo reer Amorkii buurta
degganaa ayaa idinku soo baxay oo idiin soo eryaday
sida shinnida, oo waxay idinku jebiyeen Seciir iyo tan iyo
Xormaah. 45 Markaasaad soo noqoteen oo Rabbiga hortiisa
ku ooydeen, laakiinse Rabbigu codkiinnii ma uu maqlin,
dhegna idiinma uu dhigin. 46 Sidaas daraaddeed Qaadeesh
ayaad maalmo badan degganaydeen intii ay ahaayeen
maalmihii aad halkaas degganaydeen.

2 Markaasaynu noqonnay, oo waxaynu u guurnay cidladii
ku tiil jidka Badda Cas loo maro, sidii Rabbigu igu amray,
oo in maalmo badan ah baynu ku wareegaynay Buur Seciir.
2 Markaasaa Rabbigu ila hadlay oo wuxuu igu yidhi, 3 Idinku
buurtan wakhti dheer baad ku wareegayseen, haddaba
xagga woqooyi u leexda. 4 Oo adigu waxaad dadka ku
amartaa oo ku tidhaahdaa, Idinku waxaad dhex martaan
soohdinta walaalihiin reer Ceesaw oo Seciir deggan, oo
iyana way idinka cabsan doonaan, haddaba si wanaagsan u
digtoonaada, 5 hana la diririna, waayo, dalkooda idinka siin
maayo xataa intii cagta la saaro, maxaa yeelay, Buur Seciir
hanti baan u siiyey reer Ceesaw. 6 Wax aad cuntaan lacag
kaga iibsada, oo weliba biyo aad cabtaanna lacag kaga
iibsada. 7 Waayo, Rabbiga Ilaahiinna ahu waa idinku wada
barakeeyey shuqulkii gacantiinna oo dhan, oo isagu wuu
yiqiin socodkiinnii aad cidladan soo dhex marteen. Afartankan
sannadood ayaa Rabbiga Ilaahinna ahu idinla jiray, oo waxba
uma aydaan baahan. 8 Oo sidaas daraaddeed ayaynu
walaalaheen reer Ceesaw oo Buur Seciir degganaa ku soo
dhaafnay jidka Caraabaah ee ka soo baxa Eelad iyo Cesyoon
Geber. Markaasaynu leexannay oo waxaynu soo marnay
jidka cidlada Moo'aab. 9 Markaasaa Rabbigu igu yidhi, Reer
Moo'aab ha dhibin, dagaalna ha kula diririn, waayo, dalkooda
waxba hanti idiinka siin maayo, maxaa yeelay, Caar waxaan
hanti u siiyey reer Luud. 10 (Waagii hore waxaa halkaas
degganaan jiray reer Eymiim oo ahaa dad waaweyn oo
badan oo dhaadheer sida reer Canaaq. 11 Oo kuwaasna
sida reer Canaaq ayaa waxaa la odhan jiray Refaa'iim,
laakiinse reer Moo'aab waxay iyaga ku magacaabaan reer
Eymiim. 12 Oo reer Xorna waagii hore waxay degganaan
jireen Seciir, laakiinse reer Ceesaw ayaa daba hantiyey oo
hortooda ka baabbi'iyey, oo meeshoodii degay, sida reer binu
Israa'iil ay ku sameeyeen dalkii ay hantiyeen oo Rabbigu
iyaga siiyey.) 13 Haddaba kaca oo ka gudba durdurka Sered.
Oo markaasaynu ka gudubnay durdurkii Sered. 14 Oo
wakhtigii u dhexeeyey waagii aan Qaadeesh Barneeca ka
soo kacnay iyo markii aan durdurka Sered ka soo gudubnay
wuxuu ahaa siddeed iyo soddon sannadood, ilamaa qarnigii
dagaalyahannada ahaa oo dhan laga wada baabbi'iyey
xerada dhexdeedii, sidii Rabbigu iyaga ugu dhaartay. 15
Oo weliba gacantii Rabbigu iyaga gees bay ka ahayd, si
iyaga looga wada baabbi'iyo xerada dhexdeeda jeeray wada
baabba'aan. 16 Markii dadkii dagaalyahannada ahaa oo
dhammu ay wada baabbe'een oo ay dadka dhexdiisii ka
wada le'deen, 17 ayuu Rabbigu ila hadlay oo igu yidhi, 18
Maanta waa inaad ka gudubtaa Caar oo ah soohdinta dalka
Moo'aab, 19 oo markaad u soo dhowaato reer Cammoon,
iyaga ha dhibin hana la diririn, waayo, waxba hanti idiinka siin
maayo dalka reer Cammoon, maxaa yeelay, halkaas waxaan

hanti u siiyey reer Luud. 20 (Weliba dalkaasna waxaa lagu
tiriyaa inuu yahay dalkii reer Refaa'iim, maxaa yeelay, waagii
hore waxaa halkaas degganaan jiray reer Refaa'iim, laakiinse
reer Cammoon waxay iyaga ku magacaabaan Samsummiim,
21 oo ahaa dad waaweyn oo badan oo dhaadheer sida reer
Canaaq, laakiinse Rabbiga ayaa hortooda ka baabbi'iyey,
kolkaasay daba hantiyeen oo meeshoodii degeen, 22 siduu
reer Ceesaw oo Buur Seciir deggan u sameeyey markuu
hortooda ka baabbi'iyey reer Xor oo ay daba hantiyeen
oo ay meeshoodii degeen ilaa maantadan la joogo. 23 Oo
reer Caw oo degganaa tuulooyin tan iyo Gaasa yiil waxaa
wada baabbi'iyey oo meeshoodii degay reer Kaftoriim oo
ka soo baxay Kaftoor.) 24 Haddaba kaca oo guura, oo
waxaad ka gudubtaan dooxada Arnoon. Bal eeg, waxaan
gacantaada soo geliyey boqorka Xeshboon oo Siixon ah oo
reer Amor iyo dalkiisaba. Haddaba waxaad bilowdaa inaad
dalka hantidid oo aad isaga la dagaallantaa. 25 Maanta
waxaan bilaabayaa inaan cabsidaada iyo baqdintaada ku
soo dejiyo dadyowga samada ka hooseeya oo dhan, oo
waxay maqli doonaan warkaaga, kolkaasay gariiri doonaan
oo kaa nixi doonaan. 26 Oo anigu waxaan cidladii Qedemood
uga diray boqorkii Xeshboon oo Siixon ahaa wargeeyayaal
hadallo nabdeed sida, oo waxaan ku idhi, 27 Dalkaaga
aan dhex maree. Waxaan iska marayaa jidka weyn, oo u
leexan maayo xagga midigta iyo xagga bidixda toona. 28
Wax aan cuno lacag igaga iibso, oo biyo aan cabbana lacag
iga siiso, haddaba waxaa keliyahoo aad ii yeeshaa inaan
dalka cagahayga ku dhex maro, 29 oo ii yeel siday ii yeeleen
reer Ceesaw oo deggan Buur Seciir iyo reer Moo'aab oo
deggan Caar, ilamaa aan Webi Urdun uga gudbo dalkii
Rabbiga Ilaahayaga ahu na siinayo. 30 Laakiinse Siixon oo
ahaa boqorkii Xeshboon inooma dayn inaan dalkiisa marno,
waayo, Rabbiga Ilaahaaga ah ayaa ruuxiisa qallafiyey oo
qalbigiisana wuxuu ka dhigay wax adag, si uu isaga u
soo geliyo gacantaada siday maanta tahay. 31 Markaasaa
Rabbigu wuxuu igu yidhi, Bal eeg, waxaan bilaabay inaan
Siixon iyo dalkiisaba gacantaada soo geliyo, haddaba
waxaad bilowdaa inaad hantidid aad dalkiisa dhaxashide. 32
Markaasaa Siixon iyo dadkiisii oo dhammu inagu soo kaceen
oo waxay inagula dirireen Yahas. 33 Oo Rabbiga Ilaaheenna
ahu isaguu soo geliyey gacanteenna, oo innana waynu
dilnay isagii iyo wiilashiisii iyo dadkiisii oo dhanba. 34 Oo
waagaasaynu wada qabsannay magaalooyinkiisii oo dhan,
oo magaalooyinkii la degganaa oo dhanna waynu wada
baabbi'innay, iyo dumarkii iyo dhallaankiiba, cidna kama
aynu reebin. 35 Laakiin waxaynu booli ahaan u qaadannay
xoolihii iyo alaabtii magaalooyinka aynu qabsannay. 36 Oo
magaalo inagu adag laguma arag tan iyo Carooceer oo
ku taal dooxada Arnoon qarkeeda, iyo tan iyo magaalada
dooxada ku dhex taal iyo tan iyo Gilecaad, maxaa yeelay,
Rabbiga Ilaaheenna ah ayaa kulligood gacanta inoo geliyey.
37 Laakiinse waxaa keliyahoo aadan u soo dhowaan dalkii
reer Cammoon, iyo Webi Yabboq dhinaciisa oo dhan, iyo
magaalooyinka dalka buuraha leh, iyo meel alla meeshii uu
Rabbiga Ilaaheenna ahu inoo diiday.

3 Markaasaynu leexannay oo waxaynu fuulnay jidka
Baashaan u baxa, kolkaasaa waxaa inagu soo baxay
Coog oo ahaa boqorkii Baashaan iyo dadkiisii oo dhan
inay inagula diriraan Edrecii. 2 Markaasuu Rabbigu igu
yidhi, Isaga ha ka cabsan, waayo, gacantaan kuu geliyey
isaga iyo dadkiisa oo dhan iyo dalkiisaba, oo waxaad
isaga ku samaysaa wixii aad ku samaysay Siixon oo ahaa
boqorkii reer Amor oo Xeshboon degganaa. 3 Oo sidaasuu
Rabbiga Ilaaheenna ahu Coogna oo ahaa boqorkii Baashaan
iyo dadkiisii oo dhanba gacanteenna u soo geliyey, oo
waynu wada laynay ilaa aan isagii midna u hadhin. 4 Oo
waagaasaynu magaalooyinkiisii oo dhan wada qabsannay,
oo magaalo aynaan isaga ka qabsan lama arag, oo waxaynu
qabsannay lixdan magaalo oo ahayd gobolkii Argob oo
dhan, kaasoo ahaa boqortooyadii Coog ee Baashaan ku tiil.
5 Oo intaas oo dhammu waxay ahaayeen magaalooyin ay ku
wada deyran yihiin derbiyo dhaadheer iyo irdo iyo qataarro,
oo aanay ku jirin magaalooyin faro badan oo aan deyrnayn.
6 Oo dhammaantood waynu wada duminnay, oo waxaynu ku
samaynay sidii aynu Siixon oo boqorkii Xeshboon ahaa ku
samaynay oo kale, waynu wada baabbi'innay magaalo kasta
oo la degganaa, iyo dumarkii iyo dhallaankiiba. 7 Laakiinse
waxaynu booli ahaan u qaadannay xoolihii iyo alaabtii
magaalooyinka. 8 Oo waagaas ayaynu dalka kala baxnay
farihii labadii boqor oo reer Amor oo degganaa Webi Urdun
shishadiisa tan iyo dooxada Arnoon iyo ilaa Buur Xermoon.
9 (Reer Siidoon waxay Xermoon ku magacaabaan Siryon,
reer Amorna waxay ku magacaabaan Seniir.) 10 Waxaynu
wada qaadannay magaalooyinkii bannaanka ku yiil oo dhan,
iyo dalkii Gilecaad oo dhan, iyo Baashaan oo dhan, iyo
tan iyo Salkaah iyo Edrecii kuwaasoo ahaa magaalooyinkii
boqortooyadii Coog oo Baashaan ku yiil oo dhan. 11 (Waayo,
boqorkii Baashaan oo ahaa Coog keligiis ayaa ka hadhay
dadkii reer Refaa'iim, oo bal eeg, sariirtiisu waxay ahayd
sariir bir ah, oo dhererkeedu wuxuu ahaa sagaal dhudhun,
ballaadhkeeduna wuxuu ahaa afar dhudhun, markii nin
dhudhunkiis lagu qiyaaso. Sariirtaas sow ma oollin Rabbaah
oo ku taal dalka reer Cammoon?) 12 Oo dalkan waagaas

ayaan hanti u qaadannay. Oo tan iyo Carooceer oo ku
taal dooxada Arnoon agtiisa, iyo dalka buuraha leh oo reer
Gilecaad badhkiis iyo magaalooyinkiisaba waxaan siiyey
reer Ruubeen iyo reer Gaad. 13 Oo waxaan qabiilka reer
Manaseh badhkiis siiyey Gilecaad inteeda kale iyo Baashaan
oo dhan oo ah boqortooyadii Coog, intaasoo ah gobolka
Argob oo dhan iyo xataa Baashaan oo dhan. (Oo intaas
waxaa lagu magacaabaa dalkii reer Refaa'iim. 14 Reer
Yaa'iir oo ahaa ina Manasehna wuxuu qabsaday gobolka
Argob oo dhan iyo tan iyo soohdinta reer Geshuur iyo reer
Macakaah, oo Baashaanna wuu isugu magacaabay oo
u bixiyey Hawood Yaa'iir, oo ilaa maantadanna waa loo
yaqaan.) 15 Oo Gilecaadna waxaan siiyey reer Maakiir. 16
Oo reer Ruubeen iyo reer Gaadna waxaan Gilecaad ka siiyey
tan iyo dooxada Arnoon taas oo ah dooxada badhtankeeda
oo ah soohdinta, iyo xataa ilaa Webi Yabboq kaasoo ah
soohdinta reer Cammoon, 17 iyo Caraabaah, iyo Webi Urdun
oo soohdinta ah, tan iyo Kinnered iyo xataa ilaa badda
Caraabaah oo ah Badda Cusbada oo ka hoosaysa dalcadaha
Buur Fisgaah xaggeeda bari. 18 Oo waagaas waxaan idinku
amray oo idinku idhi, Rabbiga Ilaahiinna ahu dalkan buu
idiin siiyey inaad hantidaan. Raggiinna dagaalyahanka ah oo
dhammu idinkoo hub wata walaalihiinna reer binu Israa'iil hor
mara oo gudba. 19 Laakiinse afooyinkiinna iyo yaryarkiinna
iyo xoolihiinnu ha iska joogeen magaalooyinkiinna aan idin
siiyey, (waayo, waan ogahay inaad xoolo badan leedihiin,
) 20 ilaa uu Rabbigu nasiyo walaalihiin siduu idiin nasiyey
oo kale, oo iyana ay hantiyaan dalka Rabbiga Ilaahiinna
ahu uu iyaga ka siinayo Webi Urdun shishadiisa, markaas
ninkiin waluba ha ku soo noqdo hantidiisa aan siiyey. 21
Oo waagaas ayaan Yashuuca amray oo waxaan ku idhi,
Indhahaagu way arkeen kulli wixii Rabbiga Ilaahaaga ahu uu
ku sameeyey labadan boqor. Oo boqortooyooyinka aad u
gudbaysid oo dhan Rabbigu saasuu u gelayaa. 22 Haddaba
ha ka cabsanina, waayo, waxaa idiin dagaallamaya Rabbiga
Ilaahiinna ah. 23 Markaasaan Rabbiga baryay oo waxaan
idhi, 24 Sayidow, Ilaahow, waxaad bilowday inaad anoo
addoonkaaga ah i tusto weynaantaada iyo gacantaada
xoogga badan, waayo, waa kee ilaaha ku jiraa samada
amase dhulka oo samayn kara shuqulladaada oo kale
iyo falimahaaga waaweyn oo kale? 25 Haddaba waan ku
baryayaaye, aan u gudbo oo aan arko dalka wanaagsan oo
ka shisheeya Webi Urdun, kaasoo ah buurtaas wanaagsan
iyo Lubnaan. 26 Laakiinse Rabbigu idinka daraaddiin buu igu
cadhooday, imana uu maqlin. Markaasaa Rabbigu wuxuu
igu yidhi, Intaasu ha kugu filnaato, oo mar dambe xaalkaas
ha igala hadlin. 27 Haddaba u kac Buur Fisgaah dusheeda,
oo indhaha ku taag xagga galbeed iyo xagga woqooyi iyo
xagga koonfureed iyo xagga bari, maxaa yeelay, adigu ka
gudbi maysid Webigan Urdun. 28 Laakiinse Yashuuca amar,
oo dhiirrigeli, oo xoogee, waayo, isagu wuu gudbi doonaa oo
dadkan hor kici doonaa, oo wuxuu dhaxalsiin doonaa dalka
aad arki doontid. 29 Sidaas daraaddeed waxaan degnay
dooxada ka soo hor jeedda Beytfecoor.

4 Haddaba reer binu Israa'iilow, maqla qaynuunnada iyo
xukummada aan idin barayo oo yeela si aad u noolaataan,
oo aad u gashaan oo aad u hantidaan dalkii Rabbiga ah
Ilaaha awowayaashiin uu idin siinayo. 2 Oo erayga aan
idinku amrayo wax ha ku darina, waxna ha ka dhimina, si
aad u dhawrtaan amarrada Rabbiga Ilaahiinna ah oo aan
idinku amrayo. 3 Indhihiinnaad ku aragteen wixii Rabbigu
sameeyey Bacal Fecoor aawadiis, maxaa yeelay, nimankii
Bacal Fecoor raacay oo dhan Rabbiga Ilaahiinna ahu
dhexdiinna wuu ka wada baabbi'iyey. 4 Laakiinse intiinnii ku
hadhay Rabbiga Ilaahiinna ah midkiin kastaaba maanta waa
nool yahay. 5 Bal eega, qaynuunno iyo xukummo ayaan
idiin baray sidii Rabbiga Ilaahayga ahu igu amray, inaad
saas ku dhex samaysaan dalka aad u gelaysaan inaad
hantidaan. 6 Haddaba iyaga dhawra oo sameeya, maxaa
yeelay, taasu waa xigmaddiinna iyo waxgarashadiinna aad
ummadaha hortooda ku yeelanaysaan, kuwaasoo markay
qaynuunnadan oo dhan maqlaan odhan doona, Hubaal
quruuntan weynu waa dad xigmad leh oo waxgarad ah. 7
Waayo, bal waa tee quruunta weyn oo leh ilaaha saas iyada
ugu dhow, siduu inoogu dhow yahay Rabbiga Ilaaheenna ahu
mar alla markaynu barinno? 8 Oo bal waa tee quruunta weyn
oo haysataa qaynuunno iyo xukummo xaq u ah siduu yahay
sharcigan oo dhammu ee aan maanta idin hor dhigayo? 9
Laakiin digtoonaada oo naftiinna aad u dhawra, si aydaan
u illoobin wixii indhihiinnu arkeen oo ayan cimrigiinna oo
dhan qalbigiinna uga bixin, iyagase ogeysiiya carruurtiinna
iyo carruurtiinna carruurtooda. 10 Xusuusta maalintii aad
Rabbiga Ilaahiinna ah hortiisa istaagteen oo aad Xoreeb
joogteen, markii Rabbigu igu yidhi, Dadka ii soo shiri, oo
anna waxaan maqashiinayaa erayadayda inay bartaan inay
iga cabsadaan intay dhulka ku nool yihiin oo dhan, oo ay
carruurtoodana saas baraan. 11 Oo idinkuna waad soo
dhowaateen oo waxaad istaagteen buurta hoosteedii, oo
buurtiina waxaa ka qaxmayay dab samada ku tolan, oo
waxaa jiray madow, iyo daruur, iyo gudcur qaro weyn. 12
Markaasaa Rabbigu idinkala hadlay dabka dhexdiisii, oo
idinku waxaad maqasheen erayada codkoodii, laakiinse
wax qaab leh ma aydaan arkin, waxaase keliyahoo aad

maqasheen cod. 13 Oo wuxuu idiin caddeeyey axdigii uu
idinku amray inaad samaysaan, kaasoo ah tobanka amar,
oo wuxuu iyaga ku qoray laba loox oo dhagax ah. 14
Oo markaas Rabbigu wuxuu igu amray inaan idin baro
qaynuunno iyo xukummo, inaad ku dhex samaysaan dalka
aad ugu gudbaysaan inaad hantidaan. 15 Haddaba aad u
digtoonaada, waayo, wax qaab leh ma aydaan arkin cayn
kasta ha ahaadee maalintii Rabbigu dabka dhexdiisa idinkala
hadlay oo aad joogteen Buur Xoreeb, 16 waaba intaasoo
aad iskharribtaan, oo aad samaysaan sanam xardhan qaab
kasta ha lahaadee, oo u eg lab ama dhaddig, 17 ama u
eg dugaagga dhulka jooga, ama u eg haadda cirka dhex
duusha, 18 ama u eg wax dhulka gurguurta, ama u eg wax
kalluun ah oo ku jira biyaha dhulka ka hooseeya. 19 Ama
waa intaasoo aad indhaha samada kor ugu taagtaan, oo
markaad aragtaan qorraxda iyo dayaxa iyo xiddigaha oo ah
ciidanka samada oo dhan, laydin jiitaa oo aad caabuddaan
iyaga, oo aad u adeegtaan, kuwaasoo Rabbiga Ilaahiinna
ahu u qaybiyey dadyowga samada ka hooseeya oo dhan.
20 Laakiinse Rabbigu wuu idin qaatay, oo wuxuu idinka
soo bixiyey foornadii birta ee dalkii Masar, inaad isaga u
noqotaan dad isaga keliyahu leeyahay, siday maantadan
tahay. 21 Oo weliba Rabbigu wuu iigu cadhooday idinka
daraaddiin, oo wuxuu ku dhaartay inaanan Webi Urdun ka
gudbin, iyo inaanan gelayn dalka wanaagsan oo Rabbiga
Ilaahiinna ahu dhaxal idiin siinayo, 22 laakiinse anigu waa
inaan dalkan ku dhintaa, oo waa inaanan Webi Urdun ka
gudbayn, laakiinse idinku waad gudbi doontaan, waanad
hantiyi doontaan dalkaas wanaagsan. 23 Digtoonaada,
waaba intaasoo aad illowdaan axdigii Rabbiga Ilaahiinna
ahu idinla dhigtay, oo aad samaysaan sanam xardhan oo u
eg waxyaalihii Rabbiga Ilaahiinna ahu idiin diiday. 24 Waayo,
Rabbiga Ilaahiinna ahu waa dab wax baabbi'iya oo waa Ilaah
masayr ah. 25 Markaad carruur dhashaan oo carruurtiinnuna
carruur sii dhasho, oo aad dalka wakhti dheer sii joogtaan, oo
aad iskharribtaan, oo aad samaysataan sanam qaab kasta
ha lahaadee, oo aad samaysaan wax shar ku ah Rabbiga
Ilaahiinna ah hortiisa, oo aad isaga ka cadhaysiisaan, 26
waxaan samada iyo dhulka maanta ugu yeedhayaa inay
idinku marag furaan, inaad dhaqso uga wada baabbi'i
doontaan dalka aad Webi Urdun uga gudbaysaan inaad
hantidaan. Dalkaas cimrigiinnu kuma raagi doono, laakiinse
kulligiin waad wada baabbi'i doontaan. 27 Oo Rabbigu
wuxuu idinku kala firdhin doonaa dadyowga dhexdooda,
oo quruumaha Rabbigu xaggooda idiin hoggaamin doono
idinkoo yar ayaad ku dhex hadhi doontaan. 28 Oo halkaas
waxaad u adeegi doontaan sanamyo gacma dad lagu
sameeyey oo ah qoryo iyo dhagax, oo aan waxba arag,
waxna maqal, oo aan wax cunin, waxna urin. 29 Laakiinse
haddaad halkaas Rabbiga Ilaahiinna ah ka doondoontaan,
waad heli doontaan, haddaad qalbigiinna oo dhan iyo
naftiinna oo dhan ku doondoontaan. 30 Markaad dhib ku
dhex jirtaan, oo waxyaalahan oo dhammu ay idinku dhacaan,
marka u dambaysa waxaad ku soo noqon doontaan Rabbiga
Ilaahiinna ah, codkiisana waad dhegaysan doontaan, 31
maxaa yeelay, Rabbiga Ilaahiinna ahu waa Ilaah naxariis
badan, oo isagu idin gabi maayo, idinna baabbi'in maayo,
illoobina maayo axdigii uu awowayaashiin ugu dhaartay.
32 Bal haatan weyddii waayihii tegey oo idinka horreeyey,
ilamaa maalintii Ilaah dadka ku abuuray dhulka, iyo samada
geesteed ilaa geesteeda kale, inay jireen ama la maqlay wax
sidan oo kale u weyn. 33 War weligeed dad ma maqlay codkii
Ilaah oo ka hadlaya dab dhexdiisa sidaad u maqasheen oo
kale, oo ma sii noolaaday? 34 Oo weligiis Ilaah maysku dayay
inuu quruun dhexdeed kala soo baxo quruun kale, oo ma
kaga soo bixiyey jirrabaadyo, iyo calaamooyin, iyo yaabab,
iyo dagaal, iyo gacan xoog badan, iyo cudud fidsan, sidii
Rabbiga Ilaahiinna ahu idinkoo u jeeda uu idiinku sameeyey
dalkii Masar? 35 Oo taas waxaa laydiin tusay inaad ogaataan
in Rabbigu yahay Ilaah, oo isaga mooyaane mid kale ma
jiro. 36 Oo isagu samaduu codkiisa idinka maqashiiyey
si uu wax idiin baro, oo dhulka dushiisana wuxuu idinka
tusay dabkiisii weynaa, oo erayadiisiina waad ka maqashay
dabka dhexdiisa. 37 Wuxuu jeclaa awowayaashiin, oo sidaas
daraaddeed ayuu doortay farcankoodii iyaga ka dambeeyey,
oo wuxuu dalkii Masar idinkaga soo bixiyey lajiriddiisa iyo
xooggiisa weyn, 38 iyo inuu hortiinna ka eryo quruumo
idinka waaweyn oo idinka xoog badan, oo uu dalkooda
idin geliyo oo uu dhaxal idiin siiyo siday maanta tahay.
39 Haddaba maanta ogaada oo qalbiga geliya in Rabbigu
yahay Ilaah jooga xagga samada sare iyo xagga dhulka
hooseba, oo isaga mooyaane uusan mid kale jirin. 40
Oo waa inaad dhawrtaan qaynuunnadiisa iyo amarradiisa
aan maanta idinku amrayo, inaad idinka iyo carruurtiinna
idinka dambaysaaba nabdoonaataan, oo uu cimrigiinnu ku
dheeraado dalka Rabbiga Ilaahiinna ahu idin siinayo inaad
weligiin lahaataan. 41 Markaasaa Muuse wuxuu gooni ka
dhigay saddex magaalo oo ku taal Webi Urdun shishadiisa
xagga qorrax ka soo baxa, 42 in gacankudhiiglihii deriskiisa
kama' u dilo, isagoo aan wakhti hore nebcayn, uu halkaas
ku cararo, iyo in hadduu magaalooyinkan middood ku cararo
uu noolaado. 43 Saddexdaas magaalona waxay ahaayeen
Beser oo ku taal cidlada ah waddanka bannaan oo uu u
doortay reer Ruubeen, iyo Raamod oo Gilecaad ku taal oo

uu u doortay reer Gaad, iyo Goolaan oo Baashaan ku taal
oo uu u doortay reer Manaseh. 44 Oo kanu waa sharcigii
Muuse hor dhigay reer binu Israa'iil, 45 kuwanuna waa
markhaatifurkii iyo qaynuunnadii iyo xukummadii uu Muuse
kula hadlay reer binu Israa'iil markay dalkii Masar ka soo
baxeen, 46 iyagoo jooga dooxada Webi Urdun ka shishaysa
oo ka soo hor jeedda Beytfecoor oo ku taal dalkii boqorkii
reer Amor oo Siixon ahaa oo Xeshboon degganaa oo Muuse
iyo reer binu Israa'iil ay dileen waagii ay dalka Masar ka soo
baxeen. 47 Oo dalkiisii bay hanti u qaateen iyo dalkii boqorkii
Baashaan oo Coog ahaa, kuwaasoo ahaa labadii boqor oo
reer Amor oo joogay Webi Urdun shishadiisa xagga qorrax
ka soo baxa. 48 Waxay qabsadeen tan iyo Carooceer oo
ku taal Dooxada Arnoon qarkiisa iyo xataa Buur Sii'oon
(taasu waa Buur Xermoon), 49 iyo Caraabaah Webi Urdun
ka shishaysa oo dhan oo xagga bari ka xigta, iyo tan iyo
badda Caraabaah oo ka hoosaysa dalcadaha Buur Fisgaah.

5 Markaasaa Muuse u wada yeedhay dadkii reer binu Israa'iil
oo dhan oo wuxuu ku yidhi, Reer binu Israa'iilow, maqla
qaynuunnada iyo xukummada aan maanta dhegahiinna kula
hadlayo inaad iyaga barataan oo aad dhawrtaan si aad u
samaysaan. 2 Rabbiga Ilaaheenna ahu innagoo Xoreeb
joogna ayuu axdi inala dhigtay. 3 Oo Rabbigu axdigaas
lama uu dhigan awowayaasheen, laakiinse wuxuu la dhigtay
innagoo ah inteenna maanta nool oo halkan wada joogta
oo dhan. 4 Oo Rabbigu isagoo buurta jooga fool ka fool
ayuu dabka dhexdiisa idiinkala hadlay, 5 (oo anna markaas
waxaan istaagay Rabbiga iyo idinka dhexdiinna si aan idiin
tuso Eraygii Rabbiga, waayo, waxaad ka cabsanayseen
dabka, oo buurtana ma aydaan fuulin, ) oo isaguna wuxuu
yidhi, 6 Anigu waxaan ahay Rabbiga Ilaahaaga ah, oo kaa
soo bixiyey dalkii Masar, iyo gurigii addoonsiga. 7 Aniga
mooyaane ilaahyo kale waa inaanad lahaan. 8 Waa inaanad
samaysan sanam xardhan, oo u eg waxa samada sare
jira, ama waxa dhulka hoose jira, ama waxa biyaha dhulka
ka hooseeya ku jira. 9 Waa inaanad iyaga u sujuudin,
ama u adeegin, waayo, aniga oo ah Rabbiga Ilaahaaga ah
waxaan ahay Ilaah masayr ah, oo xumaantii awowayaasha
waxaan soo gaadhsiinayaa carruurtooda, iyo tan iyo farcanka
saddexaad iyo kan afraad oo kuwa i neceb, 10 oo waxaan
u naxariistaa kumanyaal ah kuwa i jecel oo amarradayda
xajiya. 11 Waa inaanad magaca Rabbiga Ilaahaaga ah si
been ah ugu hadal qaadin, waayo, Rabbigu eedlaawe u
haysan maayo kii magiciisa si been ah ugu hadal qaada.
12 Dhawr maalinta sabtida inaad quduus ka dhigto sidii
Rabbiga Ilaahaaga ahu kuugu amray. 13 Lix maalmood waa
inaad hawshootaa, oo aad shuqulkaaga oo dhan qabsataa,
14 laakiinse maalinta toddobaad waa maalin sabti u ah
Rabbiga Ilaahaaga ah, oo waa inaanad shuqul qaban, adiga,
ama wiilkaaga, ama gabadhaada, ama addoonkaaga, ama
addoontaada, ama dibigaaga, ama dameerkaaga, ama mid
kasta oo xoolahaaga ah, ama qariibka irdahaaga ku jira, si
addoonkaaga iyo addoontaaduba ay u nastaan sidaada oo
kale. 15 Oo waa inaad xusuusataa inaad addoon ku ahaan
jirtay dalka Masar, oo Rabbiga Ilaahaaga ahu uu halkaas
kaaga soo bixiyey gacan xoog badan iyo cudud fidsan, oo
sidaas daraaddeed Rabbiga Ilaahaaga ahu wuxuu kugu
amray inaad dhawrto maalinta sabtida. 16 Aabbahaa iyo
hooyadaa u maamuus sidii Rabbiga Ilaahaaga ahu kugu
amray, in cimrigaagu dheeraado, oo aad ku nabdoonaatid
dalka Rabbiga Ilaahaaga ahu ku siiyo. 17 Waa inaadan qudh
gooyn. 18 Oo waa inaadan sinaysan. 19 Oo waa inaadan
waxba xadin. 20 Oo waa inaadan deriskaaga marag been ah
ku furin. 21 Oo waa inaadan damcin naagta deriskaaga,
oo waa inaanad damcin guriga deriskaaga, ama beertiisa,
ama addoonkiisa, ama addoontiisa, ama dibigiisa, ama
dameerkiisa, ama waxa deriskaagu leeyahay oo dhan. 22
Erayadaas wuxuu Rabbigu, isagoo buurta jooga, dab iyo
daruur iyo gudcur qaro weyn dhexdooda shirkiinna oo dhan
kagala hadlay cod weyn, wax kalena kuma uu darin. Oo
wuxuu ku qoray laba loox oo dhagax ah, markaasuu i siiyey.
23 Markaad codka ka dhex maqasheen gudcurka, iyadoo
buurta dab ka qaxmayo, ayaad ii soo dhowaateen idinkoo ah
madaxdii qabiilooyinkiinna iyo duqowdiinnii oo dhanba, 24
oo waxaad tidhaahdeen, Bal eega, Rabbiga Ilaaheenna ahu
wuxuu ina tusay ammaantiisa iyo weynaantiisa, codkiisiina
waynu ka maqalnay dabka dhexdiisa, oo maanta waxaan
ogaannay in Rabbigu dadka la hadlo oo uu isagu nool yahay.
25 Haddaba bal maxaynu u leennahay inaynu dhimanno?
Waayo, dabkan weyn baa ina baabbi'inaya, oo haddaynu sii
maqalno codka Rabbiga Ilaaheenna ah waynu dhimanaynaa.
26 Waayo, binu-aadmiga oo dhan bal yaa weligiis codka
Ilaaha nool oo dabka dhexdiisa ka hadlaya maqlay, sidaan u
maqalnay oo kale, oo sii noolaaday? 27 Haddaba adigu u
dhowow oo soo maqal kulli waxa Rabbiga Ilaaheenna ahu
odhan doono oo dhan, oo noo soo sheeg kulli waxa Rabbiga
Ilaaheenna ahu kuu sheegi doono oo dhan, oo annana
markaasaannu maqlaynaa oo yelaynaa. 28 Markaasaa
Rabbigu maqlay codkii erayadiinna markaad ila hadasheen,
oo Rabbigu wuxuu igu yidhi, Waan maqlay codkii erayada
dadkan, oo ay kugula hadleen, oo wixii ay ku hadleen oo
dhan si wanaagsan bay u yidhaahdeen. 29 Waxaan jeclaan
lahaa in qalbi sidaas ahu uu iyaga ku jiro si ay iiga cabsadaan

oo ay had iyo goorba u dhawraan amarradayda inay iyaga
iyo carruurtooduba weligood nabdoonaadaan! 30 Haddaba u
tag oo waxaad ku tidhaahdaa, Teendhooyinkiinnii ku noqda.
31 Laakiinse adigu waxaad soo istaagtaa halkan agtayda
ah, oo anaa kuu sheegaya amarka, iyo qaynuunnada,
iyo xukummada aad iyaga bari doontid oo dhan inay ku
sameeyaan dalka aan hantida u siinayo. 32 Haddaba waa
inaad dhawrtaan oo u samaysaan sida Rabbiga Ilaahiinna
ahu idiinku amray. Waa inaydaan u leexan xagga midigta iyo
xagga bidixda toona. 33 Waa inaad ku socotaan jidkii Rabbiga
Ilaahiinna ahu idinku amray oo dhan aad noolaataane inaad
nabdoonaataan oo uu cimrigiinnu ku dheeraado dalka aad
hantiyi doontaan.

6 Haddaba waxanu waa amarkii, iyo qaynuunnadii, iyo
xukummadii uu Rabbiga Ilaahiinna ahu amray inaan idin
baro, inaad ku dhex samaysaan dalka aad ugu gudbaysaan
inaad hantidaan, 2 oo aad Rabbiga Ilaahiinna ah ka
cabsataan, oo aad wada xajisaan qaynuunnadiisa iyo
amarradiisa aan idinku amrayo oo dhan. Waa inaad idinka iyo
wiilashiinna iyo wiilashiinna wiilashooduba wada dhawrtaan
intaad nooshihiin oo dhan in cimrigiinnu dheeraado. 3
Haddaba reer binu Israa'iilow, maqla oo yeela si aad u
nabdoonaataan oo aad ugu badataan dal caano iyo malab
la barwaaqaysan sidii Rabbiga ah Ilaaha awowayaashiin uu
idiin ballanqaaday. 4 Maqal, Israa'iilow, Rabbiga Ilaaheenna
ahu waa Rabbi keliya. 5 Waa inaad Rabbiga Ilaahaaga
ah ka jeclaataa qalbigaaga oo dhan iyo naftaada oo dhan
iyo xooggaaga oo dhan. 6 Oo erayadan aan maanta
kugu amrayo ha ku sii jireen qalbigaaga. 7 Oo waa inaad
carruurtaada aad u bartaa oo aad kula hadashaa markaad
gurigaaga fadhido, iyo markaad jid marto, iyo markaad jiifto,
iyo markaad sara joogtaba. 8 Waa inaad iyaga calaamad ka
dhigtaa oo gacantaada ku xidhaa, oo iyagu ha kuu ahaadeen
qardhaas indhaha dhexdooda kuugu xidhan. 9 Oo waa
inaad ku qortaa tiirarka albaabka gurigaaga iyo irdahaagaba.
10 Oo markii Rabbiga Ilaahiinna ahu idin geeyo dalkii uu ugu
dhaartay inuu siiyo awowayaashiin oo ahaa Ibraahim iyo
Isxaaq iyo Yacquub, oo uu idin siiyo magaalooyin waaweyn
oo wanwanaagsan oo aydaan dhisan, 11 iyo guryo waxyaalo
wanwanaagsanu ay ka buuxaan oo aydaan buuxin, iyo ceelal
qodan oo aydaan qodan, iyo beero canab ah iyo geedo
saytuun ah oo aydaan beeran, oo intaad wax ka cuntaan aad
dheregtaan, 12 de markaas iska jira oo ha illoobina Rabbigii
idinka soo bixiyey dalkii Masar iyo gurigii addoonsiga. 13 Oo
waa inaad Rabbiga Ilaahaaga ah ka cabsataa, oo u adeegtaa
oo magiciisa ku dhaaratаa. 14 Oo idinku waa inaydaan daba
gelin ilaahyo kale oo ah ilaahyada dadyowga hareerihiinna
ku wareegsan, 15 maxaa yeelay, Rabbiga Ilaahiinna ah oo
dhexdiinna joogaa waa Ilaah masayr ah, waaba intaasoo
Rabbiga Ilaahiinna ahu intuu aad idiinku cadhoodo uu
dhulka idinka wada baabbi'iyaa. 16 Waa inaydaan Rabbiga
Ilaahiinna ah u jirrabin sidaad Masaah ugu jirrabteen oo
kale. 17 Oo waa inaad aad u xajisaan Rabbiga Ilaahiinna ah
amarradiisa iyo markhaatifurkiisa iyo qaynuunnadiisa uu
idinku amray. 18 Waa inaad samaysaan wixii Rabbiga hortiisa
ku qumman oo ku wanaagsan inaad nabdoonaataan oo aad
intaad gashaan hantidaan dalka wanaagsan oo Rabbigu ugu
dhaartay awowayaashiin, 19 oo aad cadaawayaashiinna oo
dhan hortiinna ka eridaan sidii Rabbigu idiin sheegay. 20
Wakhtiga iman doona markii wiilkaagu wax ku weyddiiyo
oo kugu yidhaahdo, Markhaatifurka iyo qaynuunnada iyo
xukummada uu Rabbiga Ilaaheenna ahu idinku amray
micnahoodu waa maxay? 21 Markaas waxaad wiilkaaga ku
tidhaahdaa, Annagu Fircoon baannu addoommo ugu ahaan
jirnay dalka Masar, markaasaa Rabbigu Masar nagaga soo
bixiyey gacan xoog badan, 22 oo Rabbigu annagoo u jeedna
ayuu Masar iyo Fircoon iyo reerkiisii oo dhan ku sameeyey
calaamooyin iyo yaabab waaweyn oo adadag. 23 Oo halkaas
wuu naga soo bixiyey inuu na keeno oo na siiyo dalkii uu
ugu dhaartay awowayaasheen. 24 Oo Rabbigu waa nagu
amray inaannu samayno qaynuunnadan oo dhan oo aannu
wanaaggayaga aawadiis weligayo uga cabsanno Rabbiga
Ilaahayaga ah, inuu nolosha noogu daayo siday maanta
tahay. 25 Oo waxay inoo ahaanaysaa xaqnimo haddaynu
dhawrno oo aynu amarkan oo dhan ku samayno Rabbiga
Ilaaheenna ah hortiisa, siduu inoogu amray.

7 Markii Rabbiga Ilaahiinna ahu idin geeyo dalka aad
ugu socotaan inaad hantidaan, oo uu hortiinna ka eryo
quruumo badan oo ah reer Xeed, iyo reer Girgaash, iyo
reer Amor, iyo reer Kancaan, iyo reer Feris, iyo reer Xiwi,
iyo reer Yebuus, kuwaasoo ah toddoba quruumood oo
idinka weyn oo idinka xoog badan, 2 oo markii Rabbiga
Ilaahiinna ahu iyaga gacanta idiin soo geliyo, oo aad iyaga
laysaan, markaas waa inaad iyaga dhammaantood wada
baabbi'isaan. Waa inaydaan axdi la dhigan, oo aydaan u
naxariisan innaba. 3 Oo idinka iyo iyaga yuusan guur idin
dhex marin, oo gabadhiinna wiilkiisa ha siinina, wiilkiinna
gabadhiisana ha u guurinina. 4 Waayo, isagu wuxuu
wiilkiinna ka leexin doonaa aniga lasocodkayga inay iyagu
u adeegaan ilaahyo kale, sidaas daraaddeed Rabbiga
cadhadiisu aad bay idiinku kululaan doontaa, markaasuu
haddiiba idin baabbi'in doonaa. 5 Laakiinse iyaga waa inaad

sidan kula macaamilootaan, meelahooda allabariga waa
inaad dumisaan, oo aad tiirarkoodana burburisaan, oo aad
geedahooda Asheeraahna gooysaan, oo aad sanamyadooda
xardhanna gubtaan. 6 Waayo, waxaad Rabbiga Ilaahiinna ah
u tihiin dad quduus ah, oo Rabbiga Ilaahiinna ahu wuxuu idiin
doortay inaad ahaataan dad hanti isaga uga ah dadyowga
dhulka jooga oo dhan. 7 Badnaan aad dadadka kale ka
badan tihiin Rabbigu idiinma jeclaan oo idiinma dooran saas
aawadeed, waayo, idinku dadyowga oo dhan waad ugu
wada yaraydeen, 8 laakiinse Rabbigu wuu idin jecel yahay,
oo wuxuu doonayaa inuu oofiyo dhaartii uu awowayaashiin
ugu dhaartay, oo sidaas daraaddeed Rabbigu wuxuu idinku
soo bixiyey gacan xoog badan, oo wuxuu idinka soo furtay
gurigii addoonsiga iyo boqorkii Masar oo Fircoon ahaa
gacantiisii. 9 Haddaba bal ogaada in Rabbiga Ilaahiinna ahu
Ilaah yahay, oo isagu yahay Ilaaha aaminka ah oo axdiga
dhawra, oo tan iyo kun qarni u naxariista kuwa isaga jecel
oo amarkiisa xajiya. 10 Oo kuwa isaga necebna si uu u
baabbi'iyo ayuu abaalgudkooda toos u mariyaa; ka raajin
maayo kii isaga neceb ee abaalgudkiisa haddiiba toos buu u
marinayaa. 11 Haddaba waa inaad dhawrtaan amarka iyo
qaynuunnada iyo xukummada aan maanta idinku amrayo
inaad yeeshaan. 12 Xukummadaas haddaad maqashaan oo
aad xajisaan oo aad samaysaan ayaa Rabbiga Ilaahiinna
ahu idiin xajin doonaa axdigii iyo naxariistii uu awowayaashiin
ugu dhaartay, 13 wuuna idin jeclaan doonaa oo idin barakayn
doonaa oo idin tarmin doonaa, oo weliba wuxuu kaloo
barakayn doonaa midhaha jidhkiinna iyo midhaha dhulkiinna
oo ah hadhuudhkiinna iyo khamrigiinna iyo saliiddiinna iyo
taranka lo'diinna iyo ubadka idihiinna, dhammaan wuxuuna
ku barakayn doonaa dalkii uu awowayaashiin ugu dhaartay
inuu idin siinayo. 14 Oo dadyowga oo dhan waad ka barako
badnaan doontaan, oo idinka iyo xoolihiinna toona lab iyo
dhaddigba laguma arki doono madhalays. 15 Oo Rabbigu
wuxuu idinka qaadi doonaa cudur kasta, oo isagu idinku ridi
maayo cudurradii Masar oo xunxumaa oo aad tiqiin midnaba,
laakiinse kulligood wuxuu ku wada ridi doonaa kuwa idin
neceb oo dhan. 16 Oo waa inaad wada baabbi'isaan
dadyowga Rabbiga Ilaahiinna ahu gacanta idiin soo gelin
doono, oo waa inaydaan iyaga u nixin, oo ilaahyadoodana
waa inaydaan u adeegin, maxaa yeelay, taasu dabin bay
idiin noqonaysaa. 17 Oo haddaad qalbiga iska tidhaahdaan,
Quruumahanu way naga badan yihiin haddaba bal sidee
baannu iyaga u hanti tiri karnaa? 18 waa inaydaan ka cabsan,
oo waa inaad aad u xusuusataan wixii Rabbiga Ilaahiinna ahu
ku sameeyey Fircoon iyo dalkii Masar oo dhan. 19 Xusuusta
jirrabyadii waaweynaa oo aad aragteen, iyo calaamooyinkii,
iyo yaababkii, iyo gacantii xoogga badnayd, iyo cududdii
fidsanayd ee uu Rabbiga Ilaahiinna ahu idinku soo bixiyey,
oo sidaasoo kalaa Rabbiga Ilaahiinna ahu ku wada samayn
doonaa dadyowga aad ka cabsanaysaan oo dhan. 20 Oo
weliba Rabbiga Ilaahiinna ahu wuxuu iyaga dhexdooda u
soo diri doonaa xoon ilamaa inta ka hadhay oo dhuumatay
ay hortiinna ka wada baabba'aan. 21 Waa inaydaan iyaga ka
baqin, waayo, Rabbiga Ilaahiinna ahu dhexdiinnuu joogaa,
oo isagu waa Ilaah weyn oo laga cabsado aad iyo aad. 22
Oo Rabbiga Ilaahiinna ahu quruumahaas aayar aayar ayuu
hortiinna uga eryi doonaa. Oo waa inaydaan iyaga mar qudha
baabbi'in si aan dugaagga duurku idiinku badan. 23 Laakiinse
Rabbiga Ilaahiinna ahu gacantiinnuu soo gelin doonaa,
oo jeeray wada baabba'aan wuxuu idiinkaga nixin doonaa
naxdin weyn. 24 Oo boqorradooda wuxuu soo gelin doonaa
gacantiinna, oo magacooda waa inaad ka baabbi'isaan inta
samada ka hoosaysa, oo ninnaba ma awoodi doono inuu
hortiinna istaago jeeraad iyaga wada baabbi'isaan. 25 Oo
sanamyada xardhan oo ilaahyadooda waa inaad gubtaan, oo
aydaan damcin lacagta iyo dahabka korkooda saaran, hana
qaadanina, yeydnan siriq ku dhicine, waayo, taasu waxay
Rabbiga Ilaahiinna ah u tahay karaahiyo. 26 Gurigiinnana
waa inaydaan soo gelin wax karaahiyo ah, si aydaan sideeda
oo kale wax xaaraan ah u noqon. Waa inaad kulligood ka
yaqyaqsataan oo aad iyo aad u nacdaan, maxaa yeelay,
waxaasu waa xaaraan.

8 Oo amarka aan maanta idinku amrayo oo dhan waa inaad
wada samaysaan si aad u noolaataan oo u tarantaan
oo aad u gashaan oo u hantidaan dalkii Rabbigu ugu
dhaartay awowayaashiin. 2 Oo waa inaad xusuusataan jidkii
uu Rabbiga Ilaahiinna ahu afartankan sannadood idinku
soo dhex mariyey cidladii, si uu idiin hoosaysiiyo oo idiin
tijaabiyo si uu u ogaado wixii qalbigiinna ku jiray, bal inaad
amarradiisa xajinaysaan iyo in kale. 3 Wuu idin hoosaysiiyey,
oo gaajuu idinku riday, oo wuxuu idinku quudiyey maanna
aydaan aqoon oo awowayaashiinna ayan aqoon, inuu idin
ogeysiiyo inaan dadku kibis oo keliya ku noolaan, laakiinse
uu dadku eray walba oo afka Rabbiga ka soo baxa ku
noolaado. 4 Oo afartankan sannadood dharkiinnii aad
qabteen idinkama duugoobin oo cagihiinnuna marna ma
bararin. 5 Oo waa inaad qalbigiinna kaga fikirtaan in Rabbigu
idin edbiyo sida nin wiilkiisa u edbiyo. 6 Oo waa inaad
xajisaan amarrada Rabbiga Ilaahiinna ah inaad jidadkiisa ku
socotaan oo aad isaga ka cabsataan. 7 Waayo, Rabbiga
Ilaahiinna ahu wuxuu idin keenayaa dal wanaagsan oo
ah dal ay ka buuxaan durdurro biyo ah, iyo ilo, iyo biyo

mool dheer oo ka soo baxaya dooxooyin iyo buuro. 8
Waa dal ay ka buuxaan sarreen iyo shaciir, iyo geedo
canab ah iyo geedo berde ah, iyo rummaan, oo waa dal
ay ka buuxaan saliidsaytuun iyo malab, 9 oo waa dal aad
waayitaanla'aan kibis kaga cunaysaan oo aydaan waxba
uga baahnayn, waa dal dhagaxyadiisu ay bir yihiin, oo aad
buurihiisana naxaas ka qodan doontaan. 10 Oo intaad wax
cuntaan ayaad dhergi doontaan, oo markaasaad Rabbiga
Ilaahiinna ah ugu mahadnaqi doontaan dalka wanaagsan
oo uu idin siiyey. 11 Digtoonaada, waaba intaasoo aad
Rabbiga Ilaahiinna ah illowdaan markaad xajin weydaan
amarradiisa iyo xukummadiisa iyo qaynuunnadiisa, oo aan
maanta idinku amrayo, 12 oo markaad wax cuntaan oo
aad dheregtaan, oo aad guryo wanaagsan dhisataan oo
aad degtaan, 13 oo lo'diinna iyo idihiinnu ay tarmaan,
oo lacagtiinna iyo dahabkiinnuna ay bataan, oo waxaad
haysataan oo dhammuna ay tarmaan, 14 uu qalbigiinnu
kor u kacaa oo aad illowdaan Rabbiga Ilaahiinna ah oo
idinka soo bixiyey dalkii Masar iyo gurigii addoonsiga. 15
Isagaa idin soo dhex mariyey cidladii weynayd oo cabsida
badnayd oo ay ka buuxeen abeesooyin qaniinyo kulul
iyo hangarallayaal, oo ahaa dhul oommane ah oo aan
biyo lahayn, oo dhagaxmadowgii ayuu biyo idiinka soo
bixiyey. 16 Oo intaad cidladii joogtay ayuu idinku quudiyey
maanna aan awowayaashiinna aqoon. Waxaas oo dhan
wuxuu u sameeyey si uu idiin hoosaysiiyo oo idiin tijaabiyo,
si uu ugu dambaystiinna wanaag idiinku sameeyo, 17
waaba intaasoo aad qalbiga iska tidhaahdaan, Xooggayaga
iyo itaalka gacantayada ayaannu maalkan ku helnay. 18
Laakiinse waa inaad xusuusataan Rabbiga Ilaahiinna ah,
waayo, kan xoogga aad maalka ku heshaan idin siiyaa
waa isaga, inuu adkeeyo axdigii uu awowayaashiin ugu
dhaartay, siday maanta tahay. 19 Oo haddaad Rabbiga
Ilaahiinna ah illowdaan oo aad ilaahyo kale raacdaan oo u
adeegtaan oo caabuddaan, hubaal waxaan maanta idiin
markhaati furayaa inaad baabba'aysaan. 20 Sidii quruumihii
Rabbigu hortiinna ka baabbi'iyey oo kale ayaad idinkuna
baabba'aysaan, maxaa yeelay, waad diiddeen inaad codkii
Rabbiga Ilaahiinna ah maqashaan.

**9** Reer binu Israa'iilow, maqla, maanta waa inaad Webi
Urdun ka gudubtaan inaad gashaan oo hantidaan
quruumo idinka waaweyn oo idinka sii xoog badan iyo
magaalooyin waaweyn oo deyrkoodu samada ku tolan
yahay, 2 oo dadkoodu yihiin dad waaweyn oo dhaadheer oo
ah reer Canaaq, oo aad taqaanaan oo aad maqasheen in la
yidhi, Bal yaa reer Canaaq hor istaagi kara? 3 Haddaba
bal maanta ogaada in Rabbiga Ilaahiinna ahu yahay kan
hortiin gudbaya isagoo ah sida dab wax baabbi'iya. Iyaga
wuu baabbi'in doonaa oo hortiinnuu ku soo ridi doonaa,
oo sidaasaad u eryi doontaan oo aad haddiiba baabbi'in
doontaan, siduu Rabbigu idiin sheegay. 4 Markii Rabbiga
Ilaahiinna ahu iyaga idinka hor eryo ka dib, qalbiga ha iska
odhanina, Xaqnimadayada aawadeed ayaa Rabbigu dalkan
noo keenay inaannu hantinno, waayo, Rabbigu wuxuu
quruumahaas idiinka hor erya waa sharkoodii aawadiis.
5 Oo xaqnimadiinna iyo qummanaanta qalbigiinna midna
kuma aydaan hantiyin dalkooda, laakiinse Rabbiga Ilaahiinna
ahu quruumahaas sharkoodii aawadiis ayuu idinka hor
eryayaa, iyo in Rabbigu sii adkeeyo eraygii uu ugu dhaartay
awowayaashiin oo ahaa Ibraahim iyo Isxaaq iyo Yacquub. 6
Haddaba ogaada inuusan Rabbiga Ilaahiinna ahu dalkan
wanaagsan idiin siinayn inaad hantidaan xaqnimadiinna
aawadeed, waayo, waxaad tihiin dad madax adag. 7 Bal
xusuusta oo ha illoobina sidaad Rabbiga Ilaahiinna ah uga
xanaajiseen markaad cidladii joogteen. Oo tan iyo maalintii
aad dalkii Masar ka soo baxdeen iyo ilamaa aad halkan
timaadeen Rabbigaad ku caasiyoobayseen. 8 Oo weliba
markaad Xoreeb joogteenna Rabbiga waad ka xanaajiseen,
markaasaa Rabbigu idiin cadhooday oo wuxuu damcay
inuu idin baabbi'iyo. 9 Oo markaan buurta fuulay inaan
soo helo looxyadii dhagaxa ahaa, kuwaasoo ahaa looxyadii
uu ku qornaa axdigii Rabbigu idinla dhigtay, markaasaan
buurta joogay afartan maalmood iyo afartan habeen, oo
intaasna baadna ma cunin biyana ma cabbin. 10 Markaasaa
Rabbigu wuxuu ii soo dhiibay labadii loox oo dhagaxa
ahayd oo lagu qoray fartii Ilaah, oo waxaa ku qornaa kulli
erayadii uu Rabbigu maalintii shirka idinkagala hadlay dabka
dhexdiisa isagoo buurta jooga. 11 Afartan maalmood iyo
afartan habeen ka dib ayaa Rabbigu i soo siiyey labadii
loox oo dhagaxa ahayd, kuwaasoo ahaa looxyadii axdiga.
12 Markaasaa Rabbigu wuxuu igu yidhi, Kac oo halkan
dhaqso uga deg, waayo, dadkii aad dalkii Masar ka soo
bixisay way iskharribeen, oo haddiiba way ka leexdeen jidkii
aan ku amray, oo waxay samaysteen sanam la shubay.
13 Oo weliba waxaa kaloo Rabbigu igula hadlay oo igu
yidhi, Anigu dadkan waan arkay oo bal eeg waa dad madax
adag, 14 haddaba iska kay daa, aan baabbi'iyee, oo aan
magacooda samada hoosteeda ka tiree, oo waxaan adiga
kaa dhigi doonaa quruun iyaga ka xoog badan oo ka sii
weyn. 15 Markaasaan jeestay oo buurtii hoos uga degay,
oo buurtiina dab baa ka qaxmayay, oo labadii loox oo
axdiguna waxay ku jireen labadayda gacmood. 16 Oo anna
wax baan fiiriyey oo waxaan arkay inaad ku dembaabteen

Rabbiga Ilaahiinna ah, oo waxaad samaysateen weyl dahab
la shubay ah, oo haddiiba gees baad uga leexateen jidkii
Rabbigu idinku amray. 17 Markaasaan qaaday labadii loox,
oo labadaydii gacmood ayaan ka tuuray oo indhihiinna
hortooda ku jejebiyey. 18 Markaasaan Rabbiga hortiisa ku
dhacay oo joogay afartan maalmood iyo afartan habeen sidii
markii hore, oo anigu baadna ma cunin, biyana ma cabbin,
maxaa yeelay, sababtu waa dembigiinnii aad dembaabteen
oo dhan, markaad samayseen wax Rabbiga hortiisa shar ku
ahaa, oo aad isaga kaga xanaajiseen. 19 Maxaa yeelay,
waan ka cabsaday cadhadii iyo xanaaqii kululaa oo Rabbigu
dhirfay oo uu damcay inuu idinku baabbi'iyo. Laakiinse
Rabbigu markaasna wuu i maqlay. 20 Oo Rabbigu Haaruunna
aad buu ugu cadhooday, oo wuxuu damcay inuu isaga
baabbi'iyo, laakiinse anigu Haaruunna isla markaasaan
Rabbiga u baryay. 21 Markaasaan qaaday dembigiinnii
ahaa weyshii aad samaysateen, waanan gubay oo ku dul
joogjoogsaday oo daqiijiyey, ilaa ay sida boodhka oo kale
noqotay, oo boodhkeediina waxaan ku shubay durdurka
buurta ka soo dega. 22 Oo waxaad kaloo Rabbiga ka
cadhaysiiseen markaad Tabceeraah joogteen, iyo markaad
Masaah joogteen, iyo markaad Qibrood Xatawaah joogteen.
23 Oo markii Rabbigu Qaadeesh Barneeca idinka diray
oo uu idinku yidhi, Taga oo hantiya dalkaan idin siiyey,
waad ku caasiyowdeen amarkii Rabbiga Ilaahiinna ah, mana
aydaan rumaysan, codkiisiina ma aydaan dhegaysan. 24
Tan iyo maalintii aan idin bartay caasiyiin baad Rabbiga ku
ahaydeen. 25 Oo sidaas daraaddeed ayaan Rabbiga hortiisa
ku dhacay, oo afartan maalmood iyo afartan habeen ayaan
hortiisa joogay, maxaa yeelay, Rabbigaa yidhi, Iyagaan
baabbi'inayaa. 26 Markaasaan Rabbiga baryay oo waxaan
ku idhi, Sayidow, Ilaahow, ha baabbi'in dadka dhaxalkaaga
ah oo aad weynaantaada ku soo furatay, oo aad gacantaada
xoogga badan dalkii Masar kaga soo bixisay. 27 Bal xusuuso
addoommadaadii Ibraahim, iyo Isxaaq, iyo Yacquub, oo ha
fiirin dadkan madax adkaantooda ama xumaantooda amase
dembigooda, 28 waaba intaasoo dadkii aad dalkoodii naga
soo bixisay yidhaahdaa, Rabbigu ma u awoodin inuu iyaga
geeyo dalkii uu u ballanqaaday, oo nacaybkii uu iyaga u
qabay aawadiis ayuu u bixiyey si uu cidlada ugu laayo. 29
Laakiin iyagu waa dadkaagii iyo dhaxalkaagii aad xooggaaga
weyn iyo cududdaada fidsan ku soo bixisay.

**10** Markaasaa Rabbigu wuxuu igu yidhi, Waxaad soo
qortaa laba loox oo dhagax ah oo kuwii hore u eg, oo
buurta iigu kaalay, oo waxaad kaloo samaysataa sanduuq
qori ah. 2 Oo looxyada waxaan ku qori doonaa erayadii ku
yiil looxyadii hore oo aad jebisay, oo markaas waa inaad
sanduuqa ku dhex riddaa. 3 Sidaas daraaddeed waxaan
sanduuq ka sameeyey qori qudhac, oo waxaan soo qoray
laba loox oo dhagax ah oo u eg kuwii hore, markaasaan
buurta fuulay anigoo labadii loox gacmaha ku sida. 4 Oo
isna wuxuu looxyadii ku qoray qorniinkii kuwii hore ku yiil oo
kale, kaasoo ahaa tobankii qaynuun oo Rabbigu maalintii
shirka idinkagala hadlay dabka dhexdiisa isagoo buurta
jooga, markaasaa Rabbigu iyagii i siiyey. 5 Oo markaasaan
jeestay oo buurtii ka soo degay, oo looxyadiina waxaan
ku dhex riday sanduuqii aan sameeyey, oo halkaasay ku
jiraan, sidii Rabbigu igu amray. 6 (Markaasay reer binu
Israa'iil Bi'irod Bini Yacaqaan ka guureen, oo waxay u
kaceen Mooseeraah, oo halkaasaa Haaruun ku dhintay, oo
halkaasaa lagu aasay, oo meeshiisii shuqulkii wadaadnimada
waxaa ka adeegay wiilkiisii Elecaasaar. 7 Oo halkaasna
waxay uga guureen Gudgodaah, oo waxay Gudgodaahna
uga guureen Yaatbaataah oo ah dal leh durdurro biyo
ah. 8 Oo waagaas ayaa Rabbigu qabiilka reer Laawi u
soocay inay sanduuqa axdiga Rabbiga qaadaan, iyo inay
Rabbiga hortiisa istaagaan oo ay isaga u adeegaan, iyo inay
magiciisa ku duceeyaan, ilaa maantadan la joogo. 9 Oo
sidaas daraaddeed Laawi walaalihiis lama laha qayb iyo
dhaxal toona, dhaxalkiisa waxaa ah Rabbiga sidii Rabbiga
Ilaahaaga ahu ku yidhi.) 10 Oo anna sidii markii hore ayaan
buurta joogay afartan maalmood iyo afartan habeen, oo
Rabbigu markaasna wuu i maqlay, oo Rabbiguna inuu idin
baabbi'iyo ma uu jeclayn. 11 Markaasaa Rabbigu igu yidhi,
Kac, oo dadka hor mar, oo iyana way geli doonaan oo hantiyi
doonaan dalkii aan ugu dhaartay awowayaashood inaan
iyaga siinayo. 12 Hadda reer binu Israa'iilow, bal maxaa
Rabbiga Ilaahiinna ahu idinka doonayaa, inaad Rabbiga
Ilaahiinna ah ka cabsataan, oo aad jidadkiisa oo dhan
ku socotaan, oo aad isaga jeclaataan, oo aad Rabbiga
Ilaahiinna ah ugu adeegtaan qalbigiinna oo dhan iyo naftiinna
oo dhan, 13 oo aad xajisaan Rabbiga amarradiisa iyo
qaynuunnadiisa aan maanta idiinku amrayo wanaaggiinna
aawadiis mooyaane? 14 Bal eega, Rabbiga Ilaahiinna ah
ayaa iska leh samada, iyo samada samooyinka, iyo dhulka,
iyo waxa ku jira oo dhanba. 15 Oo waxaa keliyahoo Rabbigu
ku farxay inuu awowayaashiin jeclaado, oo farcankoodii
iyaga ka dambeeyeyna wuu doortay, kuwaasoo ah idinka ee
uu dadyowga oo dhan ka dhex doortay siday maantadan
tahay. 16 Haddaba sida jidhka loo gudo isaga jara xumaanta
qalbigiinna, oo mar dambe ha sii madax adkaanina. 17
Maxaa yeelay, Rabbiga Ilaahiinna ahu waa Ilaahii ilaahyada,
iyo Sayidkii sayidyada, oo isagu waa Ilaaha weyn oo
xoogga badan oo laga cabsado oo aan dadka u kala eexan,

laaluushna qaadan. 18 Wuxuu u garsooraa agoonta iyo
carmalka, shisheeyahana wuu jecel yahay, wuxuuna siiyaa
dhar iyo dhuuni. 19 Haddaba sidaas daraaddeed idinku
shisheeyaha jeclaada, maxaa yeelay, idinba shisheeyayaal
baad ku ahaydeen dalkii Masar. 20 Oo waa inaad Rabbiga
Ilaahiinna ah ka cabsataan, oo aad u adeegtaan, waana
inaad ku dhegtaan oo aad magiciisana ku dhaarataan.
21 Isagu waa ammaantiinnii, oo isagu waa Ilaahiinnii idiin
sameeyey waxyaalihii waaweynaa oo cabsida lahaa oo aad
indhaha ku aragteen. 22 Awowayaashiin markay Masar u
dhaadhaceen waxay ahaayeen toddobaatan qof, haatanse
Rabbiga Ilaahiinna ahu wuxuu tiradiinna ka dhigay sida
xiddigaha samada oo kale.

11 Haddaba sidaas daraaddeed waa inaad jeclaataan
Rabbiga Ilaahiinna ah, oo waa inaad had iyo goor
dhawrtaan waxa loo dhawri lahaa, iyo qaynuunnadiisa, iyo
xukummadiisa iyo amarradiisaba. 2 Oo bal idinku maanta
ogaada, waayo, la hadli maayo carruurtiinnii aan aqoon oo
aan arkin Rabbiga Ilaahiinna ah edbintiisa, iyo weynaantiisa,
iyo gacantiisa xoogga badan, iyo cududdiisa fidsan, 3 iyo
calaamooyinkiisa, iyo shuqulladiisii uu ku dhex sameeyey
Masar oo uu ku sameeyey boqorkii Masar oo Fircoon ahaa iyo
dalkiisii oo dhan, 4 iyo wixii uu ku sameeyey ciidankii Masar,
iyo fardahoodii, iyo gaadhifardoodkoodii, iyo siduu iyaga ugu
qarqiyey biyihii Badda Cas markay idin eryadeen, iyo siduu
Rabbigu iyagii u baabbi'iyey ilamaa maantadan la joogo,
5 iyo wixii uu idinku sameeyey, markaad cidladii joogtay
jeeraad meeshan timaadeen, 6 iyo wixii uu reer binu Israa'iil
oo dhan dhexdooda kaga sameeyey Daataan iyo Abiiraam
oo ahaa ilma Elii'aab oo ahaa reer Ruubeen, iyo sidii ciiddu
afkeeda u kala qaadday oo ay u liqday iyagii, iyo reerahoodii,
iyo teendhooyinkoodii, iyo wax alla wixii noolaa oo iyaga
raacay, 7 laakiinse idinka indhihiinnu way arkeen shuqulkii
weynaa oo Rabbigu sameeyey oo dhan. 8 Haddaba sidaas
daraaddeed waa inaad xajisaan amarkan aan maanta idinku
amrayo oo dhan si aad u xoogaysataan oo aad u gashaan
oo u hantidaan dalka aad ugu gudbaysaan inaad hantidaan,
9 iyo in cimrigiinnu ku dheeraado dalkii Rabbigu ugu dhaartay
awowayaashiin inuu siinayo iyaga iyo farcankooda, kaasoo
ah dal caano iyo malab la barwaaqaysan. 10 Maxaa yeelay,
dalka aad ugu gudbaysaan inaad hantidaan ma aha sidii
dalkii Masar oo aad ka soo baxdeen ee aad abuurkiinna
ku abuurteen oo aad cagihiinna ku waraabiseen sidii beer
khudaareed, 11 laakiinse dalka aad ugu gudbaysaan inaad
hantidaan waa dal leh buuro iyo dooxooyin, oo wuxuu
biyaha ka cabbaa roobka samada, 12 oo waa dal Rabbiga
Ilaahiinna ahu uu xannaaneeyo, waayo, Rabbiga Ilaahiinna
ah indhihiisa ayaa fiiriya tan iyo sannadda bilowgeeda iyo
xataa sannadda dabaadigeeda. 13 Oo haddaad aad u
dhegaysataan amarrada aan maanta idinku amrayo oo ah
inaad Rabbiga Ilaahiinna ah jeclaataan oo aad isaga ugu
adeegtaan qalbigiinna oo dhan iyo naftiinna oo dhan, 14
de markaas dalkiinna roobka waxaan siin doonaa xilligiisa
kaas oo ah roobka hore iyo roobka dambe, inaad soo
urursataan hadhuudhkiinna, iyo khamrigiinna, iyo saliiddiinna.
15 Oo berrimmadiinnana waxaan ka buuxin doonaa doog ay
xoolihiinnu daaqaan, oo idinkuna wax baad cuni doontaan,
waadna dhergi doontaan. 16 Haddaba digtoonaada, waaba
intaasoo uu qalbigiinnu idin khiyaaneeyaa, oo aad gees u
leexataan oo ilaahyo kale u adeegtaan oo caabuddaan,
17 oo markaas cadhada Rabbigu idinku kululaataa, oo
uu samada idinka xidhaa, si aad roob u weydaan, oo
uu dhulku midho soo bixin waayo, oo aad haddiiba uga
baabba'daan dalka wanaagsan oo Rabbigu idin siinayo.
18 Haddaba erayadaydan waa inaad gelisaan qalbigiinna
iyo naftiinna, oo waa inaad calaamad ahaan gacanta ugu
xidhataan, waxayna idiin ahaan doonaan wax indhihiinna
dhexdooda ka laalaada. 19 Oo waa inaad iyaga carruurtiinna
bartaan, idinkoo ku sheekaysta markaad gurigiinna dhex
fadhidaan, iyo markaad jidka martaan, iyo markaad jiiftaan,
iyo markaad sara joogtaanba. 20 Oo waa inaad iyaga ku
qortaan tiirarka albaabka gurigiinna iyo irdihiinnaba, 21 in
cimrigiinna iyo cimriga carruurtiinnuba uu dalkii Rabbigu
ugu dhaartay awowayaashiin ugu dheeraado sida cimriga
samooyinka dhulka ka sarreeya. 22 Maxaa yeelay, haddaad
aad u xajisaan kulli amarkan aan idinku amrayo oo dhan
inaad yeeshaan, kaasoo ah inaad Rabbiga Ilaahiinna ah
jeclaataan, oo aad jidadkiisa oo dhan ku socotaan, oo aad
isaga ku hadhaan, 23 markaasuu Rabbigu hortiinna ka
wada eryi doonaa quruumahaas oo dhan, oo waxaad hantiyi
doontaan quruumo idinka badan oo idinka xoog weyn. 24 Oo
meel kasta oo aad cagta dhigtaanba idinkaa iska yeelan
doona, tan iyo cidlada iyo ilaa Lubnaan iyo ilaa webiga,
kaasoo ah Webi Yufraad, iyo xataa ilaa badda galbeed.
25 Oo ninnaba ma awoodi doono inuu idin hor istaago,
oo Rabbiga Ilaahiinna ahu wuxuu dalkii aad cag marin
doontaan oo dhan saari doonaa cabsidiinna iyo naxdintiinna,
siduu idiin sheegay. 26 Bal eega, maanta waxaan idin hor
dhigayaa barako iyo habaar, 27 barakada waxaad helaysaan
haddaad dhegaysataan amarrada Rabbiga Ilaahiinna ah
oo aan maanta idinku amrayo, 28 habaarkuna wuxuu
idinku dhacayaa haddaydnan dhegaysan amarrada Rabbiga
Ilaahiinna ah, laakiin aad gees uga leexataan jidka aan

maanta idinku amrayo, oo aad ilaahyo kale oo aydnan aqoon
raacdaan. 29 Oo markii Rabbiga Ilaahiinna ahu idin geeyo
dalka aad ugu gudbaysaan inaad hantidaan, barakada waa
inaad kaga dhawaaqdaan Buur Gerisiim, habaarkana waa
inaad kaga dhawaaqdaan Buur Ceebaal. 30 War sow iyagu
kama shisheeyaan Webi Urdun xagga jidka dambe oo
qorrax-u-dhaca, oo ah dalka reer Kancaanka Caraabaah
deggan, oo ka soo hor jeedda Gilgaal, oo ku dhinac yaal
geedaha Moreh? 31 Waayo, waxaad ka gudubtaan Webi
Urdun inaad gashaan oo hantidaan dalkii Rabbiga Ilaahiinna
ahu uu idin siinayo, waadna hantiyi doontaan oo dhex degi
doontaan. 32 Oo waa inaad dhawrtaan oo wada yeeshaan
qaynuunnada iyo xukummada aan maanta idin hor dhigayo
oo dhan.

12 Kuwanu waa qaynuunnada iyo xukummada ay tahay
inaad dhawrtaan oo aad ku dhex yeeshaan dalkii
Rabbiga Ilaaha awowayaashiin ahu uu idiin siinayo inaad
hantidaan intaad dhulka ku nooshihiin oo dhan. 2 Oo idinku
hubaal waa inaad wada baabbi'isaan meelaha ay quruumaha
aad hantiyi doontaan ilaahyadooda ugu adeegi jireen oo
dhan, meelahaas oo ah kuwa buuraha dhaadheer ku kor
yaal, iyo kuwa kuraha ku yaal, iyo kuwa geed kastoo dheer oo
doog ah ku hoos yaal. 3 Oo waa inaad meelahooda allabariga
dumisaan, oo aad tiirarkoodana wada burburisaan, oo aad
geedahooda Asheeraahna gubtaan, oo sanamyada xardhan
oo ilaahyadoodana waa inaad jartaan, oo magacoodana
waa inaad meeshaas ka baabbi'isaan. 4 Waa inaydaan
Rabbiga Ilaahiinna ah saas ku samayn. 5 Laakiinse meesha
Rabbiga Ilaahiinna ahu uu qabiilooyinkiinna oo dhan ka
dooranayo inuu magiciisa halkaas dhigo, taasoo ah rugtiisa,
waa inaad doontaan, oo halkaas waa inaad timaadaan. 6 Oo
waa inaad halkaas keentaan qurbaannadiinna la gubo, iyo
allabaryadiinna, iyo meel tobnaadyadiinna, iyo qurbaanka aad
gacanta sare ugu qaaddaan, iyo waxyaalaha aad nidartaan,
iyo qurbaannada aad ikhtiyaarka u bixisaan, iyo curadyada
lo'diinna iyo adhigiinna. 7 Oo waxyaalahaas waa inaad
halkaas ku cuntaan Rabbiga Ilaahiinna ah hortiisa, oo wax
alla wixii aad gacanta ku qabataan oo uu Rabbiga Ilaahiinna
ahu idinku barakeeyey waa inaad ku faraxdaan idinka iyo
reerihiinnuba. 8 Oo waa inaydaan samayn waxyaalaha aynu
maanta halkan ku samaynayno oo dhan kuwaas oo ah waxa
nin walba la qumman, 9 waayo, idinku weli ma aydaan
gaadhin nasashada iyo dhaxalka uu Rabbiga Ilaahiinna
ahu idin siinayo. 10 Laakiinse markaad Webi Urdun ka
gudubtaan oo aad degtaan dalka Rabbiga Ilaahiinna ahu idin
dhaxalsiinayo, oo uu idinka nasiyo cadaawayaashiinna idinku
wareegsan oo dhan, si aad ammaan ugu degganaataan, 11
de markaas meesha Rabbiga Ilaahiinna ahu uu u dooranayo
in magiciisu ku jiro waa inaad wada keentaan wixii aan
idinku amrayo oo dhan, kuwaas oo ah qurbaannadiinna
la gubo, iyo allabaryadiinna, iyo meeltobnaadyadiinna, iyo
qurbaanka aad gacanta sare ugu qaaddaan, iyo wax walba
oo wanaagsan oo aad Rabbiga u nidartaan. 12 Oo Rabbiga
Ilaahiinna ah hortiisa waa inaad ku faraxdaan, idinka iyo
wiilashiinna, iyo gabdhihiinna, iyo addoommadiinna lab,
iyo addoommihiinna dhaddig, iyo ka reer Laawi oo ku jira
irdihiinna, maxaa yeelay, isagu idinlama laha qayb iyo dhaxal
toona. 13 Digtoonaada, oo qurbaannadiinna la gubo ha ku
bixinina meel alla meeshii aad aragtaanba, 14 laakiinse
qurbaannadiinna la gubo waa inaad ku bixisaan meesha
Rabbigu ka dhex dooranayo qabiilooyinkiinna middood, oo
halkaas waa inaad ku wada yeeshaan waxaan idinku amrayo
oo dhan. 15 Laakiinse waa idiin bannaan tahay inaad wax
qalataan oo aad irdihiinna gudahooda hilib ku cuntaan in alla
intii naftiinnu doonayso sida ay tahay barakadii uu Rabbiga
Ilaahiinna ahu idin siiyey, oo qofkii daahir ah iyo qofkii
aan daahir ahaynuba way u cuni karaan, sida cawsha iyo
deerada loo cuno. 16 Laakiinse waa inaydaan dhiigga cunin,
waxaadse dhulka ugu daadisaan sida biyo oo kale. 17 Laakiin
idiinma bannaana inaad irdihiinna gudahooda ku cuntaan
meeltobnaadka hadhuudhkiinna, ama kan khamrigiinna, ama
kan saliiddiinna, ama curadyada lo'diinna iyo adhigiinna,
ama wax alla wixii aad nidartaan, amase qurbaannada aad
ikhtiyaarkiinna u bixisaan, amase qurbaanka aad gacanta
sare ugu qaaddaan, 18 laakiinse iyaga waa inaad ku cuntaan
Rabbiga Ilaahiinna ah hortiisa taasoo ah meesha Rabbiga
Ilaahiinna ahu dooranayo. Midkiin kasta iyo wiilkiisa iyo
gabadhiisa, iyo addoonkiisa iyo addoontiisa, iyo ka reer
Laawi oo irdihiisa ku jira, meeshaas ha ku cuneen, oo
idinkoo Rabbiga hor jooga waa inaad ku faraxdaan wax alla
wixii aad gacanta ku qabataanba. 19 Haddaba digtoonaada,
oo reer Laawi ha dayrinina in alla intaad dalkiinna ku
nooshihiin oo dhan. 20 Markii Rabbiga Ilaahiinna ahu uu
soohdintiinna u ballaadhiyo siduu idiin ballanqaaday, oo
aad tidhaahdaan, Waxaannu doonaynaa inaan hilib cuno,
sababtoo ah nafsaddiinna oo doonaysa inay hilib cunto,
markaas way idiin bannaan tahay inaad hilib cuntaan in alla
inta nafsaddiinnu doonayso. 21 Haddii meesha Rabbiga
Ilaahiinna ahu uu u dooranayo inuu magiciisa dhigo ay idinka
fog tahay, markaas waa inaad lo'diinna iyo adhigiinna uu
Rabbigu idin siiyey wax uga qalataan sida aan idinku amray,
oo waa inaad irdihiinna gudahooda ku cuntaan in alla inta
nafsaddiinnu doonayso. 22 Oo waxaad iyaga u cuntaan sida
loo cuno cawsha iyo deerada, oo qofkii daahir ah iyo qofkii

aan daahir ahaynuba isku si ha u cuneen. **23** Laakiinse waxaa keliyahood hubsataan inaydaan dhiigga cunin, waayo, dhiiggu waa nolosha, haddaba waa inaydaan cunin hilibka noloshiisu la jirto. **24** Waa inaydaan dhiigga cunin, waxaadse dhulka ugu daadisaan sida biyo oo kale. **25** Waa inaydaan cunin, si aad u nabdoonaataan idinka iyo carruurtiinna idinka dambaysaba, markaad yeeshaan waxa ku qumman Rabbiga hortiisa. **26** Laakiinse waxyaalihiinna quduuska ah oo aad haysataan iyo waxyaalihii aad nidartaanba waa inaad qaaddaan oo aad geeysaan meesha Rabbigu dooranayo, **27** oo waa inaad qurbaannadiinna la gubo, hilibka iyo dhiiggaba ku kor bixisaan meesha allabariga oo Rabbiga Ilaahiinna ah, oo allabarigiinna dhiiggiisana waa in lagu shubo meesha allabariga oo Rabbiga Ilaahiinna ah, hilibkase waa inaad cuntaan. **28** Dhawra oo dhegaysta erayadan aan idinku amrayo oo dhan, si aad idinka iyo carruurtiinna idinka dambaysaba weligiin u nabdoonaataan, markaad yeeshaan waxa wanaagsan oo ku qumman Rabbiga Ilaahiinna ah hortiisa. **29** Markii Rabbiga Ilaahiinna ahu hortiinna ka wada gooyo quruumaha aad ugu socotaan inaad hantidaan, oo aad hantidaan ee aad dalkooda iska degtaan, **30** digtoonaada, yaan dabin laydinku qabsan si aad iyaga u raacdaan, markii iyaga hortiinna laga baabbi'iyo ka dib, oo ha haybsanina ilaahyadooda oo ha odhanina, War quruumahanu sidee bay ugu adeegaan ilaahyadooda? Annana sidaas oo kalaannu yeelaynaaye. **31** Waa inaydaan Rabbiga Ilaahiinna ah saas ku samayn, maxaa yeelay, wax kasta oo Rabbigu karahsado oo uu neceb yahay ayay iyagu ilaahyadooda ku sameeyaan, oo xataa wiilashooda iyo gabdhahooda bay u gubaan ilaahyadooda. **32** Oo wax alla wixii aan idinku amrayo waa inaad dhawrtaan oo yeeshaan, waxna ha ku darina, waxna ha ka dhimina.

**13** Hadduu dhexdiinna ka kaco nebi ama mid riyooyin ku riyooda, oo uu idin tuso calaamad ama yaab, **2** oo calaamadda amase yaabku haddu rumoobo oo la arko wixii uu idinkula hadlay isagoo leh, Ina keena aynu ilaahyo kale raacnee oo aynu iyaga u adeegnee kuwaas oo aydaan aqoonin, **3** waa inaydaan dhegaysan erayada nebigaas ama riyaalowgaas, waayo, Rabbiga Ilaahiinna ahu wuu idin tijaabinayaa inuu ogaado bal inaad Rabbiga Ilaahiinna ah ka jeceshihiin qalbigiinna oo dhan iyo naftiinna oo dhan iyo in kale. **4** Waa inaad Rabbiga Ilaahiinna ah raacdaan oo ka cabsataan, oo waa inaad amarradiisa xajisaan oo codkiisa addeecdaan, waana inaad isaga u adeegtaan oo ku hadhaan. **5** Oo nebigaas ama riyaalowgaas waa in la dilaa, maxaa yeelay, wuxuu ku hadlay wax ku caasinimo ah Rabbiga Ilaahiinna ah oo idinka soo bixiyey dalkii Masar oo idinka soo furtay gurigii addoonsiga, si uu idiinka leexiyo jidkii Rabbiga Ilaahiinna ahu idinku amray inaad ku socotaan. Oo sidaas waa inaad shar dhexdiinna uga saartaan. **6** Oo haddii walaalkaa oo ah wiilkii hooyadaa, ama wiilkaaga, ama gabadhaada, ama naagtaada laabta kaaga jiifta, ama saaxiibkaaga sida naftaada kula mid ahu uu si qarsoodi ah kugu sasabo oo uu ku yidhaahdo, Ina keen aynu u adeegno ilaahyo kale kuwaasoo aadan aqoon, adiga iyo awowayaashaa toona, **7** ee ah ilaahyada dadyowga hareerihiinna ku wareegsan ha ahaadeen kuwa kuu dhow ama kuwa kaa fog ee jooga dunida geesteed iyo xataa tan iyo geesteeda kale, **8** kaas waa inaadan la heshiin, oo isaga ha dhegaysan, hana u nixin, hana u tudhin, hana qarin isaga, **9** laakiinse kaas hubaal waa inaad dishaa, oo gacantaadu ha ahaato tan ugu horraysa oo isaga disha, dabadeedna dadka oo dhammu ha u gacan qaadeen. **10** Oo waa inaad dhagxisaa si uu u dhinto, maxaa yeelay, wuxuu damcay inuu kaa fogeeyo Rabbiga Ilaahaaga ah oo idinka soo bixiyey dalkii Masar iyo gurigii addoonsiga. **11** Oo reer binu Israa'iil oo dhammu way maqli doonaan, wayna cabsan doonaan, oo mar dambe ma ay samayn doonaan shar la mid ah sida kan idinku dhex jira oo kale. **12** Oo haddaad wax ka maqashaan mid ka mid ah magaalooyinka Rabbiga Ilaahiinna ahu idiin siinayo inaad degtaan, **13** iyadoo la leeyahay, Dad waxmatarayaal ah baa dhexdiinna ka baxay oo waxay jiiteen dadkii magaaladooda degganaa, iyagoo leh, Ina keena oo aynu u adeegno ilaahyo kale, kuwaasoo aydaan aqoon, **14** markaas waa inaad weyddiisaan oo baadhaan, oo aad iyo aad u haybisaan, oo bal eeg, haddii taasu run tahay, oo ay tahay wax hubaal ah, in karaahiyada caynkaas ah dhexdiinna lagu sameeyey, **15** markaas dadka magaaladaas deggan hubaal waa inaad seef ku laysaan, oo dhammaanteed waa inaad wada baabbi'isaan, oo kulli waxa magaaladaas ku jira iyo xoolaheedaba seef ku laaya. **16** Oo alaabteeda dhaca ah oo dhanna waxaad ku soo ururisaan jidka dhexdiisa, oo waa inaad Rabbiga Ilaahiinna ah dhammaan u gubtaan magaalada iyo alaabteeda oo dhanba, oo weligeed waxay ahaan doontaa tuulmo, oo mar dambena lama dhisi doono. **17** Oo gacantiinna yaanay waxba kaga hadhin alaabta xaaraanta ah, in Rabbigu ka soo noqdo cadhadiisii kululayd, oo uu siduu awowayaashiin ugu dhaartay idiinku naxariisto, oo idiinku naxo, oo idiin tarmiyo, **18** markaad dhegaysataan Rabbiga Ilaahiinna ah codkiisa, inaad xajisaan amarradiisa aan maanta idinku amrayo oo dhan, oo aad samaysaan waxa ku qumman Rabbiga Ilaahiinna ah hortiisa.

**14** Idinku waxaad tihiin Rabbiga Ilaahiinna ah carruurtiisii,
haddaba qof dhintay aawadiis jidhkiinna ha u goynina,
oo indhihiinna dhexdoodana ha u xiirina. **2** Waayo, waxaad
Rabbiga Ilaahiinna ah u tihiin dad quduus ah, oo Rabbigu
wuxuu idiin doortay inaad ahaataan dad hanti isaga uga ah
dadyowga dhulka jooga oo dhan. **3** Waa inaydaan cunin
innaba wax karaahiyo ah. **4** Kuwanu waa xayawaanka aad
hilibkooda cunaysaan, oo waa lo'da, iyo idaha, iyo riyaha, **5**
iyo deerada, iyo cawsha, iyo dibtaagta, iyo garannuugta, iyo
goodirka, iyo biciidka, iyo adhidibadeedka. **6** Xayawaan kasta
oo raafkiisu kala jeexan yahay, oo calyanaqsiga raamsado oo
xayawaanka ka mid ah kaas waa inaad cuntaan. **7** Habase
yeeshee kuwa caynkan ah oo calyanaqsiga raamsado oo
raafka jeexan leh waa inaydaan cunin, kuwaasoo ah geela
iyo bakaylaha iyo walada, maxaa yeelay, calyanaqsiga way
raamsadaan laakiinse raafkoodu ma kala jeexna, oo iyagu
waa idinka nijaas, **8** oo doofaarkana ha cunina, maxaa yeelay,
isaga raafkiisu waa kala jeexan yahay, calyanaqsigase
ma raamsado, sidaas daraaddeed waa idinka nijaas, oo
kuwaas hilibkooda waa inaydaan cunin, bakhtigoodana waa
inaydaan taaban. **9** Waxa biyaha ku dhex jira oo dhan
kuwan ka cuna: wax alla wixii baalal iyo qolfo leh cuna,
**10** laakiinse wax alla wixii aan baalal iyo qolfo lahayn waa
inaydaan cunin, maxaa yeelay, waa idinka nijaas. **11** Haadda
daahirka ah oo dhan waad cuni kartaan. **12** Laakiinse ha
cunina haadda caynkan ah: baqalyada, iyo babawga, iyo
saratoosiyaha, **13** iyo xuunshada, iyo shimbirlaayaha, iyo
faragooysta caynkeeda, **14** iyo cayn kasta oo tuke ah, **15** iyo
gorayada, iyo aboodiga, iyo shimbirbadeedda, iyo cayn kasta
oo haadka adag ah, **16** iyo guumaysta yar, iyo guumaysta
weyn, iyo guumaysgeesaleyda, **17** iyo cantalyaaga, iyo
gorgorka, iyo xeebajoogta, **18** iyo xuurta, iyo haadbiyoodda
iyo caynteeda, iyo ceelaljoogta, iyo fiidmeerta. **19** Oo wax
baalal leh oo gurguurta oo dhammu waa idinka nijaas, oo
iyaga waa inaan la cunin. **20** Laakiinse haadda daahirka ah
oo dhan waad cuni kartaan. **21** Oo wax alla wixii iska dhinta
waa inaydaan cunin, laakiinse shisheeyihii irdihiinna ku jira
waad siin kartaan isagu ha cunee, amase ajnabiga waad ka
iibsan karaysaan, waayo, waxaad Rabbiga Ilaahiinna ah u
tihiin dad quduus ah. Oo waxar waa inaydaan ku karsan
caanihii hooyadeed. **22** Oo waa inaad toban meelood meel
ka bixisaa midhaha abuurkaaga oo ah waxa sannad kasta
beerta kaaga baxa oo dhan. **23** Oo Rabbiga Ilaahaaga
ah meesha uu u dooranayo inuu magiciisa dhigo hortiisa
waa inaad ku cuntaa meel tobnaadka hadhuudhkaaga,
iyo kan khamrigaaga, iyo kan saliiddaada, iyo curadyada
lo'daada iyo kuwa adhigaaga, inaad barato inaad Rabbiga
Ilaahaaga ah ka cabsato had iyo goorba. **24** Oo haddii jidku
kugu dheer yahay, oo aad u qaadi kari weydo, meesha kaa
fog aawadeed oo uu Rabbiga Ilaahaaga ahu u dooranayo
inuu magiciisa dhigo, markii Rabbiga Ilaahaaga ahu ku
barakeeyo, **25** markaas waa inaad lacag u beddeshaa, oo
aad lacagta gacanta ku qabsataa, oo markaas waa inaad
tagtaa meesha Rabbiga Ilaahaaga ahu dooranayo, **26** oo
markaas waxaad lacagta ku soo iibsataa wax alla wixii
naftaadu doonayso oo ah dibi, ama ido, ama khamri, ama
wax lagu sakhraamo, ama wax alla wixii nafsaddaadu ku
weyddiisato, oo waxaad ku cuntaa Rabbiga Ilaahaaga ah
hortiisa, oo waa inaad adiga iyo reerkaaguba faraxdaan. **27**
Oo waa inaadan dayrin kan reer Laawi oo irdahaaga ku jira,
maxaa yeelay, isagu qayb iyo dhaxal midna idinlama laha.
**28** Oo saddex sannadood oo kasta markay dhammaadaanba
waa inaad soo bixisaa meeltobnaadka waxa sannaddaas
kuu baxay, oo waxaad ku kaydsataa irdahaaga gudahooda.
**29** Oo markaas waxaa iman oo ka cuni oo ka dhergi doona
kan reer Laawi, waayo, isagu idinlama laha qayb iyo dhaxal
toona, iyo qariibka, iyo agoonta, iyo carmalka inuu Rabbiga
Ilaahaaga ahu kugu barakeeyo shuqulka aad gacantaada ku
qabato oo dhan.

**15** Oo toddoba sannadood oo kastaa markay
dhammaadaan waa inaad saamaxaad samaysaan.
**2** Oo sidaad saamaxaad u samaynaysaan waa sidatan:
mid kasta oo deyn baxshayba ha saamaxo wixii uu
deriskiisa deynshay, oo waa inuusan ka qaadan deriskiisa
iyo walaalkiis toona, maxaa yeelay, waxaa la naadiyey
Rabbiga saamaxaaddiisii. **3** Kii shisheeye ah waad ka
qaadan karaysaan, laakiinse wax alla wixii aad leedihiin
oo gacanta walaalkiin ku jira waa inaad saamaxdaan. **4** Si
kastaba ha ahaatee mid miskiin ah waa inaan dhexdiinna
laga helin, (maxaa yeelay, hubaal Rabbigu waa idinku
barakayn doonaa dalka Rabbiga Ilaahiinna ahu uu dhaxalka
idiin siinayo inaad hantidaan, ) **5** haddii keliyahoo aad
aad u dhegaysataan codka Rabbiga Ilaahiinna ah, oo
aad dhawrtaan oo yeeshaan amarkiisa aan maanta idinku
amrayo oo dhan. **6** Maxaa yeelay, Rabbiga Ilaahiinna ahu
waa idiin barakayn doonaa siduu idiin ballanqaaday, oo wax
baad deymin doontaan quruumo badan, laakiinse waxba
kama amaahan doontaan, oo quruumo badan baad u talin
doontaan, laakiinse iyagu idiinma ay talin doonaan. **7** Hadduu
kula joogo nin miskiin ah oo walaalahaa midkood ah ee ku
jira irdahaaga middood ee dalka Rabbiga Ilaahaaga ahu
ku siinayo, waa inaadan qalbiga ka qallafin, gacantana ka
xidhin walaalkaaga miskiinka ah. **8** Laakiinse hubaal waa

inaad gacanta u furtaa oo hubaal waa inaad deymisaa intii
baahidiisa ku filan. 9 Digtoonow, oo yaan fikir xun qalbigaaga
gelin adoo isku leh, Sannaddii toddobaad ee saamaxaaddu
waa soo dhow dahay. Walaalkaaga miskiinka ah si aan
naxariis lahayn ha u eegin inaadan waxba siin. Haddii kalese
Rabbiguu kaaga caban doonaa, oo taasuna dembi bay kugu
noqon doontaa. 10 Hubaal waa inaad isaga wax siisaa, oo
markaad wax siisona qalbigaagu yuusan xumaan, maxaa
yeelay, taas daraaddeed ayaa Rabbiga Ilaahaaga ahu kugu
barakayn doonaa shuqulkaaga oo dhan iyo wax alla wixii
aad gacanta ku qabatoba. 11 Waayo, masaakiintu weligood
dalka kama ay dhammaan doonaan, haddaba waxaan kugu
amrayaa oo kugu leeyahay, Hubaal waa inaad gacanta
u furtaa walaalkaa iyo kaaga baahan iyo masaakiintaada
dalkaaga joogta. 12 Oo haddii qof walaalkaa ah oo ah nin
Cibraani ah amase naag Cibraaniyad ah lagaa iibiyo oo
uu lix sannadood kuu adeego, sannadda toddobaad waa
inaad xoraysaa. 13 Oo markaad xorayso waa inaadan dirin
isagoo faro madhan. 14 Waa inaad si deeqsinimo ah isaga
uga xoolagooysaa idahaaga iyo hadhuudhka goobtaada
lagu tumo iyo waxa macsarada canabkaaga ku jira, oo
sidii Rabbiga Ilaahaaga ahu uu kuu barakeeyey waa inaad
isaga wax u siisid. 15 Oo waa inaad xusuusataa inaad
dalkii Masar addoon ku ahaan jirtay oo Rabbiga Ilaahaaga
ahu ku soo furtay, oo sidaas daraaddeed baan maanta
waxan kuugu amrayaa. 16 Oo hadduu kugu yidhaahdo,
Dooni maayo inaan kaa baxo, oo sababtuna ay tahay
jacayl uu u qabo adiga iyo reerkaaga, iyo nabdoonaan uu
kugu qabo, 17 kolkaas waa inaad mudac qaaddaa oo aad
dhegtiisa albaabka kula daloolisaa, oo isna weligiis addoon
buu kuu ahaan doonaa. Oo weliba addoontaadana sidaas
oo kale ku samee. 18 Oo markaad xoraysid yaanay kula
ahaan wax adag, waayo, isagu lixdaas sannadood wuxuu
kuugu adeegay sidii shaqaale la kiraysto laba jibbaarkiis. Oo
Rabbiga Ilaahaaga ahuna wuu kugu barakayn doonaa wax
alla wixii aad samaysidba. 19 Kulli curadyada labka ah oo ka
dhasho lo'daada iyo adhigaagaba waa inaad quduus uga
dhigtid Rabbiga Ilaahaaga ah, oo waa inaadan ku shaqaysan
curadka lo'daada, oo aadan dhogortana ka xiirin curadka
idahaaga. 20 Sannad kasta adiga iyo reerkaaguba waa inaad
kuwaas ku cuntaan Rabbiga Ilaahaaga ah hortiisa taasoo ah
meesha Rabbigu dooranayo. 21 Oo haddii curadku leeyahay
iin ah addinla'aan ama indhala'aan, ama hadduu leeyahay iin
xun wax kasta ha ahaatee, waa inaadan Rabbiga Ilaahaaga
ah allabari ugu bixin. 22 Waa inaad irdahaaga gudahooda
ku cuntaa, oo qofkii daahir ah iyo kii aan daahir ahaynuba
isku si ha u cuneen sida cawsha iyo deerada oo kale. 23
Laakiinse waa inaadan dhiiggiisa cunin, waxaadse dhulka
ugu daadisaa sida biyo oo kale.

16 Bisha Aabiib dhawra, oo Rabbiga Ilaahiinna ah Iiddii
Kormaridda u sameeya, waayo, bisha Aabiib ayaa
Rabbiga Ilaahiinna ahu habeennimo idinka soo bixiyey dalkii
Masar. 2 Oo Iidda Kormaridda waa inaad Rabbiga Ilaahiinna
ah u bixisaan neef aad ka qaaddaan idaha iyo lo'da, uguna
bixiya meesha uu Rabbiga u dooranayo inuu magiciisa
dhigo. 3 Oo allabariga waa inaydaan kibis khamiir leh ku
cunin, toddoba maalmoodse waa inaad ku cuntaan kibis aan
khamiir lahayn oo ah kibistii dhibka, waayo, dalkii Masar
degdeg baad kaga soo baxdeen. Waa inaad cimrigiinna
oo dhan xusuusnaataan maalintii aad dalkii Masar ka soo
baxdeen. 4 Oo intii toddoba maalmood ah soohdimihiinna
gudahooda oo dhan waa inaan khamiir lagu arag, oo
allabariga aad fiidka maalinta kowaad bixisaan hilibkiisu
waa inuusan habeenkii oo dhan oollin oo subaxdii gaadhin.
5 Idiinma bannaana inaad allabariga Iidda Kormaridda ku
bixisaan irdihiinna gudahooda oo Rabbiga Ilaahiinna ahu
uu idin siinayo, 6 laakiinse meesha Rabbiga Ilaahiinna ahu
uu u dooranayo inuu magiciisa dhigo waa inaad allabariga
Kormaridda ku bixisaan markay fiidka tahay, oo qorraxdu
dhacdo, oo ah xilligii aad Masar ka soo baxdeen. 7 Hilibka
waa inaad dubtaan oo ku cuntaan meesha Rabbiga Ilaahiinna
ahu uu dooranayo, oo subaxdii waa inaad noqotaan oo
teendhooyinkiinna tagtaan. 8 Lix maalmood waa inaad
cuntaan kibis aan khamiir lahayn, oo maalinta toddobaadna
shir quduus ah waa inaad u qabataan Rabbiga Ilaahiinna
ah, oo maalintaas waa inaydaan waxba shuqul qaban.
9 Waxaad tirsataan toddoba toddobaad, oo hadhuudhka
taagan markaad manjada ku bilowdaan kolkaas waa inaad
bilowdaan inaad tirsataan toddoba toddobaad. 10 Oo Iiddii
Toddobaadyada ee Rabbiga Ilaahiinna ah waa inaad ugu
samaysaan waxyaalaha aad ikhtiyaarkiinna gacmaha ugu
bixisaan, oo taas waxaad u bixisaan sida Rabbiga Ilaahiinna
ahu idiin barakeeyo. 11 Midkiin kasta iyo wiilkiisa, iyo
gabadhiisa, iyo addoonkiisa, iyo addoontiisa, iyo kii reer
Laawi oo irdihiisa ku jira, iyo qariibka, iyo agoonta iyo
carmalka idin dhex joogaaba waa inay ku wada farxaan
Rabbiga Ilaahooda ah hortiisa taasoo ah meesha Rabbiga
Ilaahooda ahu uu u dooranayo inuu magiciisa dhigo. 12 Oo
waa inaad xusuusnaataan inaad addoommo ku ahaydeen
dalkii Masar, oo waa inaad dhawrtaan oo samaysaan
qaynuunnadan. 13 Oo markaad wax ka soo urursataan
goobihiinna hadhuudhka lagu tumo iyo macsarooyinkiinna
canabka, dabadeed waa inaad dhawrtaan Iidda Waababka

intii toddoba maalmood ah. 14 Oo midkiin kasta iyo wiilkiisa,
iyo gabadhiisa, iyo addoonkiisa, iyo addoontiisa, iyo ka reer
Laawi, iyo qariibka, iyo agoonta, iyo carmalka irdahooda
ku jiraaba waa inay ku wada farxaan iiddiinna. 15 Oo intii
toddoba maalmood ah waa inaad iid Rabbiga Ilaahiinna ah
ugu qabataan meesha Rabbigu dooranayo, maxaa yeelay,
Rabbigu wuxuu idinku barakayn doonaa waxa idiin kordha oo
dhan iyo shuqulka gacmihiinna oo dhan, oo dhammaantiin
waxaad ahaan doontaan farax miidhan. 16 Oo sannaddiiba
saddex jeer raggiinna oo dhammu waa inay Rabbiga
Ilaahiinna ah kaga hor muuqdaan meeshuu dooranayo, oo
saddexdaas jeer waa Iidda Kibista-aan-khamiirka-lahayn,
iyo Iidda Toddobaadyada, iyo Iidda Waababka, oo waa
inaanay iyagoo fara madhan Rabbiga hortiisa ka muuqan.
17 Nin waluba waa inuu bixiyo wixii uu awoodo sida ay tahay
barakada Rabbiga Ilaahiinna ahu uu idin siiyey. 18 Oo dalka
Rabbiga Ilaahiinna ahu uu idin siinayo irdihiinna oo dhan
siday qabiilooyinkiinnu yihiin u samee xaakinno iyo saraakiil,
oo iyana dadka ha ugu garsooreen garsoor xaq ah. 19
Waa inaydaan garta qalloocin, oo dadkana waa inaydaan u
kala eexan, oo laaluushna waa inaydaan qaadan, waayo,
laaluushku wuu indhatiraa kuwa xigmadda leh, oo erayada
kuwa xaqa ahna wuu qalloociyaa. 20 Oo wixii dhammaan
xaq ah waa inaad raacdaan, inaad noolaataan, oo aad
dhaxashaan dalka Rabbiga Ilaahiinna ahu uu idin siinayo.
21 Oo meesha allabariga ee Rabbiga Ilaahiinna ah oo aad
samayn doontaan agtiisa ha ka beeran geed Asheeraah
cayn kastoo uu yahay toona. 22 Oo hana qotonsan tiir uu
Rabbiga Ilaahiinna ahu neceb yahay.

**17** Rabbiga Ilaahiinna ah waa inaydaan allabari ugu bixin
dibi ama wan ay ku yaallaan iin ama wax xun oo
kale, waayo, taasu waxay Rabbiga Ilaahiinna ah u tahay
karaahiyo. 2 Oo magaalooyinkiinna Rabbiga Ilaahiinna
ahu uu idin siinayo haddii laga dhex helo nin ama naag
sameeya wax Rabbiga Ilaahiinna ah hortiisa shar ku ah
isagoo axdigiisa ka gudba, 3 oo intuu taga u adeega
ilaahyo kale, oo caabuda iyaga, ha ahaadeen qorraxda,
ama dayaxa, amase ciidanka samada midkood, taasoo
aanan anigu ku amrin, 4 haddii laydiin soo sheego oo aad
maqashaan, markaas waa inaad dadka aad u haybisaan, oo
bal eega, haddii ay run tahay iyo wax xaqiiqa ah in reer
binu Israa'iil lagu sameeyey wax karaahiyo oo caynkaas
ah, 5 kolkaas waa inaad irdihiinna keentaan ninkaa ama
naagtaa waxan sharka ah sameeyey, oo qofkaasu nin ama
naag ha ahaadee waa inaad dhagxisaan si ay u dhintaan. 6
Oo kii la dilayo, markii laba ama saddex qof ku markhaati
furaan waa in la dilo, laakiinse qof keliya markhaatigiisa waa
inaan lagu dilin. 7 Oo markhaatiyaashu waa inay marka
hore u gacan qaadaan qofkaas, dabadeedna dadka oo
dhammu waa inay u gacan qaadaan. Oo sidaas waa inaad
sharka dhexdiinna uga saartaan. 8 Oo haddii dhexdiinna ka
kaco xaal garsoorid ah oo idinku adag oo ku saabsan dhiig,
ama gar, ama dhaawac, oo xaalalkaas irdihiinna gudahooda
lagaga murmo, kolkaas waa inaad kacdaan oo tagtaan
meesha Rabbiga Ilaahiinna ahu dooranayo. 9 Oo waa inaad
u tagtaan wadaaddada reer Laawi iyo xaakinka wakhtigaas
joogi doono, oo waa inaad xaalkaas haybisaan oo iyana
waxay idiin sheegi doonaan xukunkaas garsooriddiisa. 10
Oo waa inaad u samaysaan sida xukunka garsooriddiisu
tahay, taasoo ay idiinka sheegi doonaan meesha Rabbiga
Ilaahiinna ahu uu dooranayo, oo waa inaad dhawrtaan oo
wada samaysaan waxa ay idin bari doonaan oo dhan. 11 Oo
siduu yahay sharciga ay idin bari doonaan, iyo siduu yahay
xukunka ay idiin sheegi doonaan waa inaad u samaysaan.
Xukunka ay idiin sheegi doonaan waa inaydaan uga leexan
xagga midigta ama xagga bidixda toona. 12 Oo ninkii
kibra oo diidaa inuu maqlo wadaadka Rabbiga Ilaahiinna
ah hortiisa u taagan inuu u adeego, amase xaakinka,
ninkaas waa in la dilaa, oo sharka waa inaad reer binu
Israa'iil ka saartaan. 13 Markaasay dadka oo dhammu
maqli doonaan, oo cabsan doonaan, oo kibir dambena ma
samayn doonaan. 14 Oo markaad gashaan dalka Rabbiga
Ilaahiinna ahu uu idin siinayo, oo intaad hantidaan aad dhex
degtaan, haddaad istidhaahdaan, Waxaannu doonaynaa
inaannu boqor u boqranno sida quruumaha hareerahayaga
ku wareegsan oo kale, 15 si kastaba ha ahaatee waa inaad
boqrataan kii Rabbiga Ilaahiinna ahu doorto. Oo mid aad
walaalihiinna kala soo dhex baxdaan waa inaad boqrataan.
Waa inaydaan shisheeye aan walaalkiin ahayn boqor ka
dhigan. 16 Laakiinse isagu waa inuusan fardo badsan, oo
dadkana uusan Masar dib ugu celin si uu fardo u badsado,
maxaa yeelay, Rabbigu wuxuu idinku yidhi, Hadda ka dib
jidkaas waa inaydaan dib ugu noqon. 17 Oo naagona waa
inuusan badsan si aan qalbigiisu Rabbiga uga leexan, oo
lacag iyo dahabna waa inuusan aad u badsan. 18 Oo markuu
carshiga boqortooyadiisa ku fadhiisto waa inuu naqil ah
sharcigan kitaab kaga qoro waxa wadaaddada reer Laawi
hortooda yaal, 19 oo naqilkaas waa inuu haystaa, oo waxa ku
qoran waa inuu cimrigiisa oo dhan akhristaa inuu barto si uu
uga cabsado Rabbiga Ilaahiisa ah inuu wada xajiyo oo yeelo
erayada sharcigan iyo qaynuunnadan oo dhan, 20 si uusan
qalbigiisu kor ugaga kicin walaalihiis, oo uusan amarka uga
leexan xagga midigta ama xagga bidixda toona, in isaga iyo

carruurtiisuba ay boqortooyada ku cimridheeraadaan reer
binu Israa'iil dhexdooda.

**18** Wadaaddada reer Laawi iyo xataa qabiilka reer Laawi
oo dhan waa inayan reer binu Israa'iil qayb iyo dhaxal
toona la yeelan, laakiinse waa inay cunaan qurbaannada
Rabbiga oo dabka lagu sameeyo iyo isaga dhaxalkiisa. 2
Oo iyagu waa inayan walaalahood dhaxal ku dhex yeelan.
Dhaxalkooda waxaa ah Rabbiga siduu u sheegay. 3 Oo
dadka allabariga bixiya waxaa ku waajib ah inay wadaadka
siiyaan, hadday dibi bixiyaan iyo hadday wan bixiyaanba,
garabka iyo labada daan iyo caloosha. 4 Oo isaga waa inaad
siisaan waxa ugu horreeya hadhuudhkiinna iyo khamrigiinna,
iyo saliiddiinna, iyo dhogorta ugu horraysa idihiinna. 5
Waayo, Rabbiga Ilaahiinna ah ayaa isaga ka dhex doortay
qabiilooyinkiinna oo dhan inuu isagu istaago oo ku adeego
magaca Rabbiga, isaga iyo carruurtiisuba weligood. 6 Oo
haddii mid reer Laawi ahu uu ka soo baxo magaalooyinkiinna
middood, taasoo ah meeshuu dalka Israa'iil ka degganaa,
oo isagoo aad u doonaya inuu yimaado meesha Rabbigu
uu dooranayo, 7 markaas waa inuu ku adeegaa magaca
Rabbiga Ilaahiisa ah siday wada yeelaan walaalihiisa reer
Laawi oo Rabbiga hortiisa taagan oo dhammu. 8 Oo iyagu
waa inay cunaan qayb isle'eg, oo aanay ku jirin waxa laga
helo xoolaha aabbahood oo la iibiyo. 9 Oo markaad gashaan
dalkii Rabbiga Ilaahiinna ahu uu idin siinayo waa inaydaan
baran inaad samaysaan waxyaalaha karaahiyo ah oo ay
quruumahaasu sameeyaan. 10 Oo dhexdiinna waa inaan
laga helin mid wiilkiisa ama gabadhiisa dab dhex mariya,
ama mid faal ku isticmaala, ama mid xiddigaha ku faaliya,
ama qumay, ama mid wax fala, 11 ama falanfallow, ama mid
qof ruuxaan leh la hadla, ama sixirow, ama mid kuwa dhintay
la hadla. 12 Waayo, ku alla kii waxyaalahaas sameeyaa
waa u karaahiyo Rabbiga, oo waxyaalahan karaahiyada ah
daraaddood ayaa Rabbiga Ilaahiinna ahu iyaga hortiinna uga
eryayaa. 13 Waa inaad Rabbiga Ilaahiinna ah dhammaan u
qummanaataan. 14 Maxaa yeelay, quruumahaas aad hantiyi
doontaan waxay dhegaystaan kuwa xiddigaha ku faaliya
iyo faalshowyada kale, laakiinse idinka Rabbiga Ilaahiinna
ahu idiinma uu oggolaan inaad saasoo kale yeeshaan.
15 Oo Rabbiga Ilaahiinna ahu wuxuu dhexdiinna idiinka
kicin doonaa nebi sidayda oo kale oo walaalihiinna ka mid
ah, oo idinku waa inaad isaga dhegaysataan, 16 sidaad
Rabbiga Ilaahiinna ah uga doonayseen maalintii shirka
markaad Xoreeb joogteen oo aad tidhaahdeen, Rabbiga
Ilaahayaga ah codkiisa yaannan mar dambe maqlin, oo
dabkan weynna yaannan mar dambe arkin, si aannan u
dhiman. 17 Oo markaas Rabbigu wuxuu igu yidhi, Wixii ay
ku hadleen si wanaagsan bay u yidhaahdeen. 18 Waxaan
iyaga walaalahood uga dhex kicin doonaa nebi sidaada oo
kale ah, oo markaasaan afkiisa gelin doonaa erayadayda, oo
isna wuxuu iyaga kula hadli doonaa wax alla waxaan isaga
ku amri doono oo dhan. 19 Oo waxay noqon doontaa in ku
alla kii aan maqlin erayadayda uu magacayga ku sheegi
doono, isagaan weyddiin doonaa. 20 Laakiinse nebigii wax
aanan ku amrin leh oo si kibir ah magacayga ugu hadla,
ama kii ilaahyo kale magacood ku hadlaa, nebigaasu waa
inuu dhintaa. 21 Oo haddaad qalbigiinna iska tidhaahdaan,
Sidee baannu u garanaynaa eraygii aan Rabbigu ku hadlin?
22 Markii nebi ku hadlo magaca Rabbiga, haddii wixii uu ku
hadlay ayan ahaan oo ayan noqon, waxaas ayaa ah waxa
aanu Rabbigu ku hadlin. Nebigu si kibir ah buu u hadlay ee
waa inaydaan ka cabsan innaba.

**19** Oo markii Rabbiga Ilaahiinna ahu uu wada gooyo
quruumaha Rabbiga Ilaahiinna ahu uu dalkooda idin
siinayo oo aad meeshooda gashaan ee aad degtaan
magaalooyinkooda iyo guryahooda, 2 markaas waa inaad
saddex magaalo gaar kaga dhex dhigataan dalkiinna uu
Rabbiga Ilaahiina ahu idiin siinayo inaad hantidaan. 3 Oo waa
inaad jidka hagaagsataan oo dalka Rabbiga Ilaahiinna ahu
uu idin dhaxalsiinayona soohdimihiisa waxaad u qaybisaan
saddex meelood in gacankudhiigle kastaaba halkaas ku
cararo. 4 Oo gacankudhiiglaha halkaas ku cararayo oo
noolaanayo waa caynkan: oo waa kii deriskiisa kama' ku
dilay isagoo aan hore u necbayn, 5 sida markii nin deriskiis
duurka ugu raaco inay qoryo soo jaraan, oo gacantiisu ay
faaska qaadato inuu geedka ku jaro, oo markaas birtu intay
daabka ka siibato ku dhacdo kii deriskiisa ahaa ee uu saas ku
dhinto, markaas isagu waa inuu ku cararaa magaalooyinkaas
middood si uu ku noolaado, 6 waaba intaasoo ka aardoonka
ahu uu gacankudhiiglaha raacdaystaa intuu qalbigiisu kulul
yahay, oo uu gaadhaa jidka fog aawadiis, oo uu markaas
dilaa isagoo aan dhimasho istaahilin, maxaa yeelay, isagu
hore uma uu necbayn. 7 Oo sidaas daraaddeed waxaan
idinku amrayaa oo idinku leeyahay, Waa inaad saddex
magaalo gaar ka dhigataan. 8 Haddii Rabbiga Ilaahiinna
ahu u ballaadhiyo soohdimihiinna, siduu awowayaashiin ugu
dhaartay, oo uu idin wada siiyo dalkii uu awowayaashiin u
ballanqaaday inuu iyaga siinayo oo dhan, 9 oo haddaad
xajisaan oo wada yeeshaan amarkan aan maanta idinku
amrayo oo dhan, inaad Rabbiga Ilaahiinna ah jeclaataan oo
aad weligiin jidadkiisa ku socotaan, kolkaas saddex magaalo
oo kale oo aan saddexdan ahayn waa inaad ku darsataan, 10

si aan dhiig aan xaq qabinu loogu dhex daadin dalkii Rabbiga
Ilaahiinna ahu uu idin siinayo, waaba intaasoo dhiig idin
saarnaadaa. 11 Laakiinse haddii nin deriskiisa neceb yahay
ee uu isaga meel ugu gabbado oo uu markaas ku soo boodo
oo uu ku dhufto nabar uu u dhinto, kolkaas hadduu u cararo
magaalooyinkaas middood, 12 waayeellada magaaladiisu
waa inay cid u soo diraan, oo halkaas ka soo wadaan, oo
waa inay kii aardoonka ahaa gacantiisa ku ridaan isagu
ha dhintee. 13 Oo isaga ishiinnu yaanay u nixin, laakiinse
dhiigga aan xaqa qabin reer binu Israa'iil dhexdooda waa
inaad ka fogaysaan, si aad u nabdoonaataan. 14 Midkiinna
waa inuusan innaba durkin soohdinta deriskiisa oo hore loo
dhex qotomiyey dhaxalkiinna aad dhaxli doontaan ee dalka
Rabbiga Ilaahiinna ahu uu idiin siinayo inaad hantidaan.
15 Qof keliyahu yuusan nin ugu marag furin xumaan ama
dembi uu dembaabay toona, laakiinse wax kastaba ha lagu
adkeeyo afka laba markhaati ama saddex markhaati. 16
Haddii markhaati aan xaq ahaynu uu nin ku kaco oo uu ku
marag furo inuu xumaan sameeyey, 17 markaas labada
nin oo muranku ka dhexeeyaa waa inay soo istaagaan
Rabbiga hortiisa iyo wadaaddada iyo xaakinnada waagaas
jiri doono hortooda, 18 oo xaakinnadu waa inay xaalkaas
aad u baadhaan, oo bal eeg, haddii markhaatigu yahay
markhaati been ah, oo uu walaalkiis si been ah ugu marag
furay, 19 markaas waa inaad ku samaysaan siduu damcay
inuu walaalkiis ku sameeyo, oo sidaas waa inaad dhexdiinna
sharka uga saartaan. 20 Oo kuwa hadhay xaalkaas way
maqli doonaan oo cabsan doonaan, oo markaas ka dibna
innaba dhexdiinna shar dambe oo caynkaas ah kuma
samayn doonaan. 21 Oo ishiinnu yaanay ninna u nixin, nafu
naf ha u baxdo, ilna il ha loo rido, iligna ilig, gacanna gacan
ha loo gooyo, cagna cag.

**20** Markaad dagaal ugu baxdaan cadaawayaashiinna, oo
aad aragtaan fardo iyo gaadhifardood iyo dad idinka sii
badan, waa inaydaan ka cabsan, waayo, waxaa idinla jira
Rabbiga Ilaahiinna ah oo idinka soo bixiyey dalkii Masar. 2
Oo markaad dagaalka ku soo dhowaataan, wadaadku waa
inuu dadka u soo dhowaadaa oo la hadlaa, 3 oo ha ku
yidhaahdo, Reer binu Israa'iilow, maqla, maanta waxaad
ku soo dhowaanaysaan dagaal aad cadaawayaashiinna
kula diriraysaan, haddaba qalbigiinnu yuusan itaal darnaan,
oo ha cabsanina, hana gariirina, iyagana ha ka baqina, 4
maxaa yeelay, Rabbiga Ilaahiinna ah ayaa ah kan idinla
socda inuu idiin dagaallamo oo cadaawayaashiinna idiinka
hiiliyo si uu idiin badbaadiyo. 5 Oo saraakiishu dadka ha
la hadleen oo ha ku yidhaahdeen, Ninkee baa guri cusub
dhistay oo aan weli u ducaysan? Kaasu ha tago oo gurigiisii
ha ku noqdo, waaba intaasoo intuu dagaalka ku dhinto uu
nin kale u ducaystaaye. 6 Oo ninkee baa beer canab ah
beertay oo aan weli midhihiisii ku isticmaalin? Kaasu ha tago
oo gurigiisii ha ku noqdo, waaba intaasoo intuu dagaalka
ku dhinto uu nin kale midhihiisa ku isticmaalaaye. 7 Oo
ninkee bay naagu u doonan tahay, oo aan weli guursan?
Kaasu ha tago oo gurigiisii ha ku noqdo, waaba intaasoo
intuu dagaalka ku dhinto uu nin kale guursadaaye. 8
Oo saraakiishu weliba dadka ha la sii hadleen oo ha ku
yidhaahdeen, Ninkee baa cabsanaya oo qalbigiisu itaal
daranyahay? Kaasu ha tago oo gurigiisii ha ku noqdo, waaba
intaasoo qalbiga walaalihiis uu u baqaa sida qalbigiisoo kale.
9 Oo markay saraakiishu dadka lahadliddiisa dhammeeyaan
waa inay doortaan saraakiil ciidameed inay dadka madax
u noqdaan. 10 Markaad magaalo ugu soo dhowaataan
inaad la dirirtaan, waxaad u naadisaan war nabdeed. 11
Oo hadday jawaab nabdeed idin siiyaan oo ay albaabka
idinka furaan, waa inay dadka magaaladaas dhexdeeda
laga helo oo dhammu addoommo idiin noqdaan oo ay
idiin wada adeegaan. 12 Oo hadday idinla nabdi waayaan,
laakiinse ay doonayaan inay idinla diriraan, markaas waa
inaad hareeraysaan, 13 oo markii Rabbiga Ilaahiinna ahu
uu magaalada idiin soo gacangeliyo, dadkeeda labka ah
oo dhan waa inaad seef ku wada laysaan, 14 laakiinse
dumarka iyo dhallaanka iyo xoolaha iyo waxa magaalada
ku jira oo dhan, xataa wax kasta oo laga dhacaba waa
inaad booli ahaan u qaadataan, oo waa inaad cuntaan
xoolihii aad cadaawayaashiinna ka dhacdeen oo Rabbiga
Ilaahiinna ahu uu idin siiyey. 15 Oo sidaas waa inaad u
wada gashaan magaalooyinka idinka fog oo aan ahayn
magaalooyinka quruumahan. 16 Laakiinse magaalooyinka
dadyowga Rabbiga Ilaahiinna ahu uu dhaxalka idiin siiyey
waa inaydaan wax nool oo neefsada dhexdooda ku reebin,
17 illowse waa inaad dhammaantood u wada baabbi'isaan,
kuwaasoo ah reer Xeed, iyo reer Amor, iyo reer Kancaan,
iyo reer Feris, iyo reer Xiwi, iyo reer Yebuusba, siduu
Rabbiga Ilaahiinna ahu idiinku amray, 18 si ayan idiin barin
inaad samaysaan waxyaalahooda karaahiyada ah oo ay
ilaahyadooda ku sameeyeen oo dhan, oo aydaan idinku
saas ugu dembaabin Rabbiga Ilaahiinna ah. 19 Oo markaad
wakhti dheer magaalo dagaal ku hareeraynaysaan si aad
u qabsataan, waa inaydaan dhirteeda faas ku baabbi'in,
waayo, wax baad ka cuni karaysaan, saas aawadeed waa
inaydaan jarin. Waayo, bal geedka duurka ma nin baa oo
aad saas darteed u weerartaan? 20 Waxaad keliyahoo
baabbi'isaan oo jartaan dhirta aad garanaysaan inayan

ahayn dhir la cuno, oo magaalada idinla dirirayso waa inaad
hareeraheeda ka dhisataan dhufaysyo ilaa ay dhacdo.

21 Oo dalka Rabbiga Ilaahiinna ahu uu idiin siinayo inaad
hantidaan haddii laga dhex helo mid la dilay oo berrinka
dhex yaal, oo la aqoon waayo kii isaga dilay, 2 markaas
waa inay wadaaddadiinna iyo xaakinnadiinnu soo baxaan,
oo waa inay qiyaasaan ilaa magaalooyinka kan la dilay
hareerahiisa ku wareegsan, 3 oo magaaladii ugu dhow ninka
la dilay waa in odayaasha magaaladaasu ay lo'da ka soo
wataan qaalin aan lagu shaqaysan oo aan harqood wax ku
jiidin, 4 oo odayaasha magaaladaasu waa inay qaalinta u
wadaan dooxo biyaheedu ordayaan oo aan la jeexin, waxna
lagu beerin, oo halkaas dooxada dhexdeeda ah qaalinta
qoorta ha kaga jebiyeen. 5 Oo markaas wadaaddada ah
ilma Laawi waa inay soo dhowaadaan, waayo, Rabbiga
Ilaahiinna ahu iyaguu u doortay inay isaga u adeegaan iyo
inay ku duceeyaan magaca Rabbiga, oo muran kasta iyo
dhaawac kastaba siday iyagu yidhaahdaan ha laga yeelo.
6 Oo magaalada ninka la dilay magaalo ahaan ugu dhow
odayaasheeda oo dhammu waa inay ku kor faraxashaan
qaalintii qoorta lagaga jebiyey dooxada dhexdeeda, 7 oo
iyagu markaas ha jawaabeen oo ha yidhaahdeen, Dhiiggan
gacmahayagu ma daadin, indhahayaguna ma arag. 8
Haddaba Rabbiyow, cafi dadkaaga reer binu Israa'iil oo aad
soo furatay, oo hana u oggolaan in dhiig aan xaq qabinu uu
saarnaado dadkaaga reer binu Israa'iil. Oo markaas iyaga
waa loo kafaaro gudi doonaa dhiiggaas. 9 Oo sidaas waa
inaad dhexdiinna uga saartaan dhiigga aan xaqa qabin
markaad samaysaan waxa ku qumman Rabbiga hortiisa. 10
Oo markaad dagaal ugu baxdaan cadaawayaashiinna, oo uu
Rabbiga Ilaahiinna ahu iyaga gacmihiinna soo geliyo, oo aad
maxaabiis ahaan iyaga u kaxaysataan, 11 oo haddii midkiin
maxaabiista dhexdooda ku arko qof dumar ah oo qurux
badan, oo uu iyada jeclaado oo uu doonayo inuu naagaysto,
12 markaas waa inuu gurigiisii geeystaa, oo iyadu waa inay
timaha iska xiirtaa oo ciddiyahana iska jartaa, 13 oo dharkii
maxaabiista waa inay iska furtaa, oo gurigiisa ha joogto,
oo bil dhan ha u baroorato aabbaheed iyo hooyadeed, oo
taas dabadeed waa inuu u tagaa oo ninkeedii ahaadaa,
oo iyana naagtiisii ha ahaato. 14 Oo markaas hadduusan
iyada u bogin, waa inuu iska sii daayaa, meeshay doonayso
ha tagtee, laakiinse iyada waa inuusan marnaba lacag ku
iibin, oo waa inuusan iyada sidii addoon ula macaamiloon,
maxaa yeelay, ceeb buu ku hoosaysiiyey. 15 Haddii nin
laba naagood qabo, oo uu mid jecel yahay, tan kalena
neceb yahay, oo tan uu jecel yahay iyo tan uu neceb yahay
labaduba ay isaga carruur u dhaleen, oo haddii wiilkiisa
curadka ah tan uu neceb yahay ay dhashay, 16 maalinta uu
isagu wiilashiisa dhaxalsiiyo xoolihiisa waa inuusan naagtii
uu jeclaa wiilkeeda ka dhigin curadka ka horreeyey tii uu
nebcaa wiilkeedii ee curadka ahaa, 17 laakiinse naagtii
uu nebcaa wiilkeedu inuu curadkiisii yahay waa inuu ku
caddeeyaa qaybta labanlaabka ah ee uu ka siiyo waxa uu
haysto oo dhan, maxaa yeelay, isagu waa bilowgii xooggiisa,
oo xaqa curadnimada isagaa leh. 18 Haddii nin leeyahay
wiil madax adag oo caasi ah oo aan addeecin hadalka
aabbihiis ama hadalka hooyadiis, oo in kastoo ay edbiyaan
aan iyaga dhegaysan innaba, 19 markaas aabbihiis iyo
hooyadiis waa inay isaga soo qabtaan, oo intay odayaasha
magaaladiisa u soo bixiyaan ay iridda magaalada keenaan,
20 oo iyagu odayaasha magaaladiisa ha ku yidhaahdeen,
Wiilkayaganu waa madax adag yahay, oo waa caasi, oo
isagu dooni maayo inuu hadalkayaga addeeco. Isagu waa
rabshaalow oo waa khamriyacab. 21 Oo markaas nimanka
magaaladiisa oo dhammu waa inay isaga dhagxiyaan si
uu u dhinto. Oo sidaas waa inaad sharka dhexdiinna uga
saartaan, oo reer binu Israa'iil oo dhammu taas way maqli
doonaan, markaasay cabsan doonaan. 22 Oo haddii nin
galo dembi dhimasho istaahila, oo isaga la dilo oo aad geed
ka soo deldeshaan, 23 jidhkiisa meydka ahu waa inaan
habeenka oo dhan geedka lagu dayn, laakiinse hubaal waa
inaad isla maalintaas aastaan si aydaan ku nijaasayn dalka
uu Rabbiga Ilaahiinna ahu dhaxal idiin siiyey, maxaa yeelay,
mid kasta oo geed ka soo deldelanu wuu ka inkaaran yahay
xagga Ilaah.

22 Walaalkaa dibigiisa ama laxdiisa oo baxsi ah intaad
aragtid waa inaadan ka dhuuman, laakiinse hubaal
waa inaad walaalkaa u soo celisaa. 2 Oo walaalkaagii lahaa
hadduusan kuu dhowayn, ama haddaadan isaga aqoon,
markaas waa inaad neefka baxsiga ah gurigaaga keentaa
oo waa inaad haysaa ilaa uu kuu yimaado walaalkaa oo
doondoonaya, oo markaas waa inaad isaga u celisaa. 3
Oo waa inaad sidaas oo kale u gashaa dameerkiisa, iyo
dharkiisaba, oo waa inaad sidaas oo kale u gashaa wax alla
wixii walaalkaa ka lumay ee aad adigu heshid. Waa inaadan
ka dhuuman. 4 Haddaad aragtid walaalkaa dameerkiisa
ama dibigiisa oo jidka ku dhacay, waa inaadan ka dhuuman,
laakiinse hubaal waa inaad isaga caawisaa oo la istaajisaa.
5 Naagu waa inayan xidhan waxa nin leeyahay, oo ninna
waa inuusan guntan dhar naageed, waayo, ku alla kii waxaa
sameeyaa waa u karaahiyo Rabbiga Ilaahaaga ah. 6 Jidka
hortaadaa haddaad ka heshid shimbir buulkeed oo geed

ama dhulka ku yaal, oo ay buulka ku jiraan dhal ama ugxan iyo hooyadood oo ku fadhida dhashii ama ugxantii waa inaadan hooyada la qaadan dhasha. **7** Si kasta ha ahaatee waa inaad hooyada sii daysaa, laakiinse dhasha waad qaadan kartaa, inaad nabdoonaatid oo uu cimrigaagu ku dheeraado. **8** Markaad dhisatid guri cusub, saqafkiisa waa inaad derbi ku wareejisaa si aadan reerkaaga dhiig ugu soo jiidin haddii nin halkaas ka soo dhaco. **9** Beertaada canabka ah waa inaadan ku wada beeran iniino laba cayn oo kala duwan ah, waaba intaasoo ay midhaha oo dhammu quduus kaa noqdaan, kuwaasoo ah iniinihii aad beeratay iyo midhihii beerta canabka ah kaaga baxayba. **10** Waa inaadan beer ku jeexin dibi iyo dameer wada jira. **11** Waa inaadan guntan dhar isku darsan oo laga sameeyey dhogor idaad iyo geed linen la yidhaahdo oo isku jira. **12** Oo dharka aad guntato afartiisa darafba waa inaad faraq u yeeshaa. **13** Oo haddii nin naag guursado oo uu u tago, dabadeedna uu necbaado, **14** oo uu waxyaalo ceeb ah ka sheego ee uu magac ceeb ah u soo jiido isagoo leh, Naagtan waan guursaday oo markaan u soo dhowaaday kama aanan helin calaamadihii bikradnimada, **15** markaas gabadha aabbaheed iyo hooyadeed ha soo qaadeen calaamadihii bikradnimada gabadhooda, oo odayaasha magaalada ha ugu keeneen iridda magaalada, **16** oo markaas gabadha aabbaheed odayaasha ha ku yidhaahdo, Anigu gabadhayda ayaan ninkan siiyey inuu guursado, oo imminkana wuu neceb yahay, **17** oo bal eega, wuxuu ka soo sheegay waxyaalo ceeb ah, oo wuxuu yidhi, Gabadhaada kama aanan helin calaamadihii bikradnimada, iyadoo calaamadihii bikradnimadeedu ay kuwan yihiin. Oo iyana dharka ha ku kala bixiyeen odayaasha magaalada hortooda. **18** Oo markaas odayaasha magaaladaasu waa inay ninka qabtaan oo ay edbiyaan, **19** oo weliba waa inay ku ganaaxaan boqol sheqel oo lacag ah oo ay siiyaan gabadha aabbaheed, maxaa yeelay, isagu magac ceeb ah buu u soo jiiday bikrad reer binu Israa'iil ah. Iyana naagtiisii ha ahaato, oo isna cimrigiisa oo dhan waa inuusan furin. **20** Laakiinse haddii waxyaalahaasu run yihiin oo gabadha laga waayo calaamadihii bikradnimada, **21** markaas gabadha dibadda ha u soo bixiyeen oo ha keeneen guriga aabbaheed iriddiisa, oo dadka magaaladaas jooga oo dhammu iyada ha dhagxiyeen si ay u dhimato, maxaa yeelay, iyadu nacasnimo bay ku dhex samaysay reer binu Israa'iil oo waxay ku dhillowday gurigii aabbaheed, oo sidaas waa inaad sharka dhexdiinna uga saartaan. **22** Oo haddii la helo nin la jiifa naag nin kale qabo, markaas labadooduba waa inay dhintaan, ninkii naagta la jiifsaday iyo naagtaba, oo sidaas waa inaad sharka reer binu Israa'iil dhexdooda uga saartaan. **23** Oo haddii nin magaalada dhexdeeda ka helo gabadh bikrad ah oo nin kale u doonan, oo uu iyada la jiifsado, **24** markaas labadoodaba waa inaad soo bixisaan oo keentaan magaaladaas iriddeeda, oo waa inaad dhagxisaan si ay u dhintaan, maxaa yeelay, gabadhu magaaladay joogtay, mana ay qaylin, ninkuna ceeb buu ku hoosaysiiyey tii deriskiisa u doonanayd, oo sidaas waa inaad sharka dhexdiinna uga saartaan. **25** Laakiinse haddii nin duurka ka helo gabadh nin u doonan, oo uu ninku gabadhaas xoogo oo la jiifsado, markaas ninka iyada la jiifsaday keliyahu waa inuu dhintaa, **26** laakiinse gabadha waxba ha yeelin, maxaa yeelay, gabadha dembi dhimasho istaahilaa kuma jiro, waayo, xaalkanu wuxuu la mid yahay markii nin deriskiisa ku kaco oo dilo, **27** waayo, iyada wuxuu ka helay duurka, oo gabadha ninka u doonanuna way qaylisay oo cid iyada badbaadisana la ma arag. **28** Haddii nin helo gabadh bikrad ah oo aan ninna u doonanayn, oo intuu qabsado uu iyada la jiifsado, oo markaas iyaga la helo, **29** markaas ninkii gabadha la jiifsaday waa inuu gabadha aabbaheed siiyaa konton sheqel oo lacag ah. Iyana naagtiisa ha ahaato, maxaa yeelay, isagu ceeb buu ku hoosaysiiyey, oo isna waa inuusan furin cimrigiisa oo dhan. **30** Ninna waa inuusan qaadan naagtii aabbihiis, oo waa inuusan aabbihiis marada ka bannayn.

**23** Oo kii xiniinyaha ka tuman ama guska ka jaran waa inuusan shirka Rabbiga gelin. **2** Oo garacna waa inuusan shirka Rabbiga gelin, oo xataa hadduu toban qarni joogo farcankiisu waa inuusan shirka Rabbiga gelin. **3** Oo mid reer Cammoon ah ama mid reer Moo'aab ahu waa inuusan shirka Rabbiga gelin, xataa hadday toban qarni joogaan wax ay farcankoodu leeyihiin waa inayan weligood shirka Rabbiga gelin, **4** maxaa yeelay, markaad jidka soo socoteen, idinkama ay hor keenin kibis iyo biyo toona markaad Masar ka soo baxdeen, oo weliba waxay idiin soo kiraysteen Balcaam ina Becoor oo ka yimid Fetoor oo ku taal Mesobotamiya inuu idin habaaro aawadeed. **5** Habase yeeshee Rabbiga Ilaahiinna ahu wuu diiday inuu Balcaam dhegaysto, laakiinse Rabbiga Ilaahiinna ahu wuxuu habaarkii idiinku beddelay duco, maxaa yeelay, Rabbiga Ilaahiinna ahu wuu idin jeclaa. **6** Cimrigiinna oo dhan waa inaydaan weligiinba iyaga u doonin nabad iyo barwaaqo toona. **7** Waa inaydaan karhin mid reer Edom ah, maxaa yeelay, waa walaalkiin. Waana inaydaan karhin mid Masri ah, maxaa yeelay, dalkiisaad qariib ku ahaan jirteen. **8** Oo carruurta qarnigooda saddexaad u dhalataa ha soo galeen shirka Rabbiga. **9** Markaad cadaawayaashiinna kula

baxdaan ciidanka waa inaad wax kasta oo shar ah iska
jirtaan. 10 Oo hadduu idinku jiro nin aan nadiif ahayn oo
habeenkii isku januubay, xerada dibadda ha uga baxo, oo
waa inuusan xerada soo gelin. 11 Laakiinse markay casar
gaabadkii tahay, biyo ha ku maydho, oo kolkii qorraxdu
dhacdo, xerada ha soo galo. 12 Oo xerada dibaddeeda
waxaad ka yeelataan meel aad u baxdaan, 13 oo hubkiinna
waxaad la qaadataan taki, oo kolkaad dibadda saxaro u
fadhiisataan waa inaad takida god ku qoddaan oo intaad dib
u soo jeesataan wixii idinka soo baxay waa inaad ciid ku
aastaan. 14 Waayo, Rabbiga Ilaahiinna ahu xeradiinnuu dhex
socdaa inuu idin samatabbixiyo oo uu cadaawayaashiinnana
gacantiinna soo geliyo, oo sidaas daraaddeed xeradiinnu
waa inay quduus ahaataa si uusan dhexdiinna ugu arag
wax nijaas ah oo uusan idiinka sii jeesan. 15 Haddii addoon
sayidkiisii ka soo cararo oo uu idiin yimaado waa inaydaan
isaga sayidkiisii dib ugu celin. 16 Isagu ha idinla joogo, oo
dhexdiinna ha joogo meeshuu irdihiinna middood ka doorto
oo uu jecel yahay. Waa inaydaan isaga dulmin. 17 Dumarka
reer binu Israa'iil waa inaan laga helin dhillo, nimanka reer
binu Israa'iilna waa inaan laga helin mid khaniis ah. 18
Dhillo kiradeed iyo eey kiradiis toona waa inaydaan guriga
Rabbiga Ilaahiinna ah u soo gelin nidar aawadiis, waayo,
labadaasuba waa u karaahiyo Rabbiga Ilaahiinna ah. 19
Waa inaydaan walaalkiin intaad wax deymisaan korsaar
ka qaadan, ha ahaadeen lacag korsaar ah, ama cunto
korsaar ah, ama wax kale oo korsaar laysku deymiyo toona.
20 Kii shisheeye ah korsaar wax baad ku deymi kartaan,
laakiinse walaalkiin waa inaydaan korsaar wax ku deymin,
in Rabbiga Ilaahiinna ahu uu idinku barakeeyo wax alla
wixii aad gacanta ku qabataanba intaad joogtaan dalka
aad u gelaysaan inaad hantidaan. 21 Oo markaad Rabbiga
Ilaahiinna ah nidar u nidartaan waa inaydaan ka raagin inaad
waxaas bixisaan, waayo, Rabbiga Ilaahiinna ahu hubaal
kaas wuu idin weyddiin doonaa, oo dembi buu idinku noqon
lahaa. 22 Laakiinse haddaydnan nidar gelin taasu dembi
idinkuma ahaan doonto. 23 Wax alla wixii afkiinna ka soo
baxay waa inaad dhawrtaan oo yeeshaan sidaad Rabbiga
Ilaahiinna ah ugu nidarteen, oo wixii aad ikhtiyaarkiinna afka
ugu ballanqaaddeen waa inaad bixisaan. 24 Markaad soo
gashaan beerta canabka ah ee deriskiinna, canabka uga
dherga si alla saad doonaysaan, laakiinse waa inaydaan
weelkiinna waxba kaga qaadan. 25 Oo markaad timaadaan
hadhuudhka taagan ee deriskiinna, sabuulka gacanta waad
ku goosan kartaan, laakiinse waa inaydaan hadhuudhka
taagan ee deriskiinna manjo ku gooyn.

**24** Haddii nin naag qaato oo uu guursado, oo dabadeed
uusan raalli ka ahayn, sababtuna ay tahay ceeb uu
iyada ka dhex helay, markaas isagu ha u qoro warqaddii
furniinka oo iyada gacanta ha u geliyo, gurigiisana ha ka
eryo. 2 Oo iyadu markay gurigiisa ka tagto way tegi kartaa
oo nin kale naagtiis way noqon kartaa. 3 Oo ninka dambena
hadduu iyada nebcaado, oo uu qoro warqaddii furniinta,
oo uu iyada gacanta u geliyo, oo uu gurigiisana ka eryo,
amase haddii ninka dambe oo iyada guursaday uu dhinto, 4
ninkeedii hore oo iyada eryay yuusan mar dambe naagnimo
u qaadan, kolkii iyadu ay nijaasowday dabadeed, maxaa
yeelay, taasu Rabbiga hortiisa karaahiyo bay ku tahay, oo
waa inaydaan dembi keenin dalka Rabbiga Ilaahiinna ahu uu
dhaxalka idiin siinayo. 5 Markii nin naag dhowaan guursado
waa inuusan dagaalka gelin, hawl kalena waa inaan loo
dirin, laakiinse intii sannad ah waa inuu gurigiisa ikhtiyaar ku
joogaa oo waa inuu ka farxiyaa naagtii uu guursaday. 6
Ninna waa inuusan rahaamad u qaadan dhagaxa hoose ama
dhagaxa sare oo wax lagu shiido, waayo, taasu waxay la
mid tahay isagoo rahaamad u qaatay waxa lagu noolyahay.
7 Haddii nin la helo isagoo mid ka mid ah walaalihiisa reer
binu Israa'iil intuu xaday uu ugu macaamiloodo sidii addoon
oo kale, amase uu isaga iibiyo, markaas tuuggaas waa in la
dilaa, oo sidaas waa inaad sharka dhexdiinna uga saartaan.
8 Xagga cudurka baraska ah waa inaad isjirtaan, oo waa
inaad dhawrtaan oo yeeshaan wax alla wixii wadaaddada
reer Laawi ay idin baraan oo dhan, oo sidaan iyaga ugu
amray, idinku waa inaad saas u dhawrtaan oo u yeeshaan.
9 Bal xusuusta wixii Rabbiga Ilaahiinna ahu uu ku sameeyey
Maryan, markaad jidka soo socoteen oo aad Masar ka
soo baxdeen. 10 Markaad deriskaaga wax amaahiso, deyn
kasta ha ahaadee, waa inaadan gurigiisa gelin si aad
rahaamadda uga soo qaadato. 11 Waa inaad dibadda
istaagtaa, oo ninkii aad wax deymisay waa inuu dibadda
kuugu keenaa rahaamadda. 12 Oo isagu hadduu yahay nin
miskiin ah waa inaadan seexan adigoo rahaamaddiisa sii
haysta, 13 laakiinse hubaal waa inaad rahaamaddiisa u
celisaa markii qorraxdu dhacdo inuu dharkiisa ku seexdo
oo uu kuu duceeyo, oo taasuna waxay Rabbiga Ilaahaaga
ah hortiisa kuugu ahaanaysaa xaqnimo. 14 Waa inaadan
dulmin shaqaale la kiraystay oo miskiin ah oo baahan,
hadduu yahay walaalahaaga midkood ama hadduu yahay
shisheeyaha dalkaaga deggan oo irdahaaga ku jira. 15 Waa
inaad maalintiisa mushahaaradiisa siisaa, oo qorraxduna yay
ka dhicin adoo aan siin, maxaa yeelay, isagu waa miskiin,
oo mushahaaradiisa qalbiguu ku hayaa, waaba intaasoo uu
Rabbiga kaaga cawdaa oo ay taasu dembi kugu noqotaaye.

16 Aabbayaasha waa inaan loo dilin carruurtooda, carruurtana
waa inaan loo dilin aabbayaashood, laakiinse nin kasta waa
in loo dilaa dembigiisa uu isagu falay. 17 Waa inaydaan
qalloocin garta qariibka iyo agoonta, oo naag carmal ah
dharkeedna waa inaydaan rahaamad u qaadan, 18 laakiinse
waa inaad xusuusataan inaad dalkii Masar addoommo ku
ahaan jirteen oo Rabbiga Ilaahiinna ahu halkaas idinka
soo furtay, haddaba waan idinku amrayaa inaad waxan
samaysaan. 19 Oo markaad beertaada goosatid haddaad
xidhmo sabuullo ah beerta ku soo dhex illowdo waa inaadan
dib ugu noqon si aad u soo qaadato. Waxaa lahaan doona
qariibka iyo agoonta iyo carmalka, si uu Rabbiga Ilaahaaga
ahu kuugu barakeeyo wixii ay gacmahaagu qabtaan oo
dhan. 20 Oo markaad geedkaaga saytuunka ah midhaha ka
garaacdid, mar dambe laamaha ha ku noqon. Waxaa lahaan
doona qariibka iyo agoonta iyo carmalka. 21 Oo markaad
midhaha ka soo urursatid beertaada canabka ah waa
inaadan dib u soo xaaxaabin. Waxaa lahaan doona qariibka
iyo agoonta iyo carmalka. 22 Waa inaad xusuusataan inaad
dalkii Masar addoommo ku ahaan jirteen, haddaba waan
idinku amrayaa inaad waxan samaysaan.

**25** Haddii niman muran dhex maro, oo ay garsoorid u
yimaadaan, oo loo garsooro, markaas kii gar leh,
gartiisa ha la siiyo, kii gardaranna ciqaab ha lagu xukumo.
2 Oo haddii ninkii gardarnaa karbaash istaahilo xaakinku
waa inuu hortiisa jiifiyaa si isaga loogu hor karbaasho, oo
intii gardarradiisu ahayd ha loo tiriyo. 3 Wuxuu ku xukumi
karaa afartan karbaash, laakiinse yuusan uga sii badin,
waaba intaasoo hadduu intaas uga sii badiyo oo karbaash
badan la dhaco aad walaalkaa fududaysataa. 4 Waa inaadan
dibiga af xidhin markuu sarreenka burburinayo. 5 Haddii
walaalo wada deggan yihiin, oo midkood dhinto, laakiinse
uusan wiil lahayn, kan dhintay naagtiisu yaanay dibadda
ka guursan mid shisheeye ah. Ninkeedii walaalkiis waa
inuu u guri galo oo dumaalo, oo uu ku sameeyo wixii ku
habboon ninkeedii walaalkiis inuu ku sameeyo. 6 Si uusan
ku dhintay magiciisu reer binu Israa'iil uga dhex baabbi'in
ninkeedu wiilka ugu horreeya oo ay dhali doonto ha u
bixiyo magicii walaalkiisii dhintay. 7 Laakiinse hadduusan
ninku doonaynin inuu dumaalo naagtii walaalkiis, markaas
naagta walaalkiis waa inay odayaasha ugu tagtaa iridda
magaalada oo ay ku tidhaahdaa, Ninkaygii walaalkiis wuu
diiday inuu walaalkiis magac uga dhex kiciyo reer binu
Israa'iil, oo dooni maayo inuu igu sameeyo waxa ku habboon
in dumaashigay igu sameeyo. 8 Oo markaas odayaasha
magaaladiisu waa inay isaga u yeedhaan oo la hadlaan,
oo markaas hadduu ka soo istaago oo yidhaahdo, Dooni
maayo inaan dumaalo, 9 markaas naagta walaalkiis waa
inay ugu timaadaa odayaasha hortooda, oo ay kabtiisa
ka siibtaa, oo ay wejigana candhuuf uga tuftaa, oo iyadu
waa inay jawaabtaa oo tidhaahdaa, Saas ha lagu sameeyo
ninkii aan dhisin reerka walaalkiis. 10 Oo magiciisa reer
binu Israa'iil dhexdooda ha loogu yeedho, Reerkii kan
kabtiisii laga siibay. 11 Oo markii niman isdiriraan, haddii mid
naagtiisu u soo dhowaato si ay ninkeeda uga samatabbixiso
gacanta kan isaga dilaya, hadday gacanta soo fidiso oo ay
isaga xiniinyaha ku dhegto, 12 markaas waa inaad iyada
gacanta ka gooysaa oo aadan innaba u nixin. 13 Waa
inaadan kolaygaaga ku haysan miisaanno kala cayn ah oo
ah mid weyn iyo mid yar. 14 Oo waa inaadan gurigaaga
ku haysan weelal qiyaaseed oo kala cayn ah oo ah mid
weyn iyo mid yar. 15 Waa inaad haysataa miisaan qumman
oo xaq ah, oo waa inaad haysataa weel qiyaaseed oo
qumman oo xaq ah, in cimrigaagu ku dheeraado dalka
Rabbiga Ilaahaaga ahu uu ku siinayo. 16 Waayo, kuwa
waxyaalahaas oo kale sameeya oo ah kuwa si aan xaq
ahayn wax u sameeya oo dhan waa u karaahiyo Rabbiga
Ilaahaaga ah. 17 Bal xusuusta wixii ay reer Camaaleq idinku
sameeyeen markaad jidka soo socoteen oo aad Masar ka
soo baxdeen, 18 iyo siday jidka idiinkaga hor yimaadeen oo
ay u laayeen dabaadigiinnii, kuwaas oo ahaa kulli intiinnii
taagta darnayd oo dambaysay, markaad tabarta darnaydeen
oo daallanaydeen. Iyaguse Ilaah kama ay cabsan. 19
Sidaas daraaddeed markii Rabbiga Ilaahiinna ahu idinka
nasiyo cadaawayaashiinna hareerahiinna ku wareegsan oo
dhan, idinkoo jooga dalka Rabbiga Ilaahiinna ahu uu dhaxal
idiin siinayo inaad hantidaan aawadeed, waa inaad reer
Camaaleq ka baabbi'isaan inta samada ka hoosaysa, oo
taas ha illoobina.

**26** Oo markaad gashid dalkii Rabbiga Ilaahaaga ahu uu
dhaxalka kuu siinayo, oo aad hantido ee aad dhex
degto, 2 waa inaad keentaa midhaha dhulka kuwa ugu
horreeya oo dhan, kuwaasoo aad ka guran doonto dalka
Rabbiga Ilaahaaga ahu uu ku siinayo, oo waa inaad dambiil
ku riddaa oo kolkaas waxaad tagtaa meesha Rabbiga
Ilaahaaga ahu uu u dooranayo inuu magiciisa halkaas
dhigo. 3 Oo waa inaad u timaadaa wadaadka waagaas
joogi doono, oo waxaad ku tidhaahdaa, Waxaan maanta u
qirayaa Rabbiga Ilaahaaga ah inaan imid dalkii Rabbigu
ugu dhaartay awowayaasheen inuu ina siinayo. 4 Oo
markaas wadaadku waa inuu dambiisha gacantaada ka
qaadaa oo uu hor dhigaa meesha allabariga oo Rabbiga

Ilaahaaga ah. 5 Oo markaas waa inaad jawaabtaa oo
Rabbiga Ilaahaaga ah hortiisa ka tidhaahdaa, Aabbahay
wuxuu ahaa mid reer Suuriya ah oo warwareega. Wuxuu ku
dhaadhacay Masar, oo halkaasuu degay, isagoo reerkiisu
yar yahay, oo halkaas wuxuu ku noqday quruun weyn
oo xoog badan oo tiro badan. 6 Markaas Masriyiintii wax
xun bay nagu sameeyeen oo na dhibeen, oo waxay na
saareen addoonnimo culus. 7 Oo annana markaasaannu
Rabbiga ah Ilaahii awowayaashayo u qayshannay, kolkaasaa
Rabbigu codkayagii maqlay oo dhibkayagii iyo hawshayadii
iyo dulmigayagii arkay. 8 Markaasaa Rabbigu dalkii Masar
nagaga soo baxshay gacan xoog badan, iyo cudud fidsan,
iyo cabsi weyn, iyo calaamooyin iyo yaabab, 9 oo meeshan
buu na keenay, oo wuxuu na siiyey dalkan oo ah dal
caano iyo malab la barwaaqaysan. 10 Oo haatan Rabbiyow,
waxaan keenay dhulkii aad i siisay midhihiisii u horreeyey.
Kolkaas waa inaad midhaha hor dhigtaa Rabbiga Ilaahaaga
ah, oo aad ku sujuuddaa Rabbiga Ilaahaaga ah hortiisa.
11 Waa inaad adiga iyo kan reer Laawi ah iyo qariibka
idin dhex joogaaba ku faraxdaan kulli wanaagga Rabbiga
Ilaahiinna ahu idin siiyey adiga iyo reerkaagaba. 12 Oo
markaad wada dhammaysid bixintii meeltobnaadyada aad ka
bixinaysid midhaha kuu baxa sannadda saddexaad taasoo
ah sannaddii bixinta meeltobnaadyada, waa inaad siisaa
kan reer Laawi, iyo qariibka, iyo agoonta, iyo carmalka
inay irdahaaga gudahooda ku cunaan oo dhergaan. 13
Oo Rabbiga Ilaahaaga ah hortiisa waxaad ka tidhaahdaa,
Anigu gurigaygii waan ka soo bixiyey waxyaalihii quduuska
ahaa, oo sidaad iigu amartay oo dhan ayaan u siiyey
kan reer Laawi, iyo qariibka, iyo agoonta, iyo carmalka.
Amarradaadii midna kuma xadgudbin, mana aanan illoobin
iyagii. 14 Oo iyaga wax kama cunin anoo barooranaya,
waxna kama qaadan anigoo nijaas ah, qof dhintayna wax
ugama siin. Waan dhegaystay codkii Rabbiga Ilaahayga
ah, oo waxaan sameeyey wixii aad igu amartay oo dhan.
15 Rabbiyow, hoygaaga quduuska ah oo samada ah hoos
ka soo fiiri oo barakee dadkaaga reer binu Israa'iil, iyo
dhulkii aad na siisay oo aad ugu dhaaratay awowayaashayo
oo ah dal caano iyo malab la barwaaqaysan. 16 Maanta
Rabbiga Ilaahiinna ahu wuxuu idinku amrayaa inaad
qaynuunnadan iyo amarradan yeeshaan, haddaba sidaas
daraaddeed waa inaad xajisaan oo aad qalbigiinna oo dhan
iyo naftiinna oo dhan ka yeeshaan. 17 Oo maanta waxaad
Rabbiga u ballanqaaddeen inuu isagu Ilaah idiin yahay, iyo
inaad jidkiisa ku soconaysaan, oo aad qaynuunnadiisa iyo
amarradiisa iyo xukummadiisa xajinaysaan, oo aad codkiisa
dhegaysanaysaan. 18 Oo Rabbiguna wuxuu maanta idiin
ballanqaaday inaad ahaanaysaan dad hanti isaga u ah
siduu idiin ballanqaaday, iyo inaad xajinaysaan amarradiisa
oo dhan, 19 iyo inuu idinka sare mariyo quruumaha uu
sameeyey oo dhan xagga ammaanta iyo xagga magaca
iyo xagga sharaftaba, iyo inaad Rabbiga Ilaahiinna ah u
ahaanaysaan dad quduus ah siduu yidhi.

**27** Markaasaa Muuse iyo odayaashii reer binu Israa'iil
waxay dadkii ku amreen oo ku yidhaahdeen, Amarka
aan maanta idinku amrayo oo dhan wada xajiya. 2 Oo
maalintii aad Webi Urdun uga gudubtaan dalkii Rabbiga
Ilaahiinna ahu uu idin siinayo waa inaad dhagaxyo waaweyn
qotomisaan oo aad nuurad ku malaastaan, 3 oo waxaad ku
qortaan erayada sharcigan oo dhan markaad gudubtaan
inaad gashaan dalkii Rabbiga Ilaahiinna ahu idin siinayo oo
ah dal caano iyo malab la barwaaqaysan, sidii Rabbiga ah
Ilaahii awowayaashiin uu idiin ballanqaaday. 4 Oo markaad
Webi Urdun ka gudubtaan, waa inaad Buur Ceebaal ku
qotomisaan dhagaxyada aan maanta idinkaga amrayo, oo
iyaga waa inaad nuurad ku malaastaan. 5 Oo halkaas waa
inaad Rabbiga Ilaahiinna ah meel allabari uga dhistaan, ha
ahaato meel allabari oo dhagax ah, oo dhagaxyadeeda waa
inaydaan alaab bir ah u qaadan. 6 Oo Rabbiga Ilaahiinna ah
meeshiisa allabariga waa inaad ku dhistaan dhagaxyo aan la
qorin, oo meeshaas dusheeda waxaad Rabbiga Ilaahiinna ah
ugu bixisaan qurbaanno la gubo. 7 Oo waa inaad qurbaanno
nabaadiino sadqaysaan, oo aad halkaas ku cuntaan, oo
aad Rabbiga Ilaahiinna ah hortiisa ku faraxdaan. 8 Oo waa
inaad dhagaxyada si bayaan ah ugu qortaan sharcigan
erayadiisa oo dhan. 9 Markaasaa Muuse iyo wadaaddadii
reer Laawi waxay la hadleen reer binu Israa'iil, oo waxay ku
yidhaahdeen, Reer binu Israa'iilow, aamusa oo dhegaysta.
Maanta waxaad noqoteen dadkii Rabbiga Ilaahiinna ah. 10
Haddaba waa inaad addeecdaan codka Rabbiga Ilaahiinna
ah, oo aad yeeshaan amarradiisa iyo qaynuunnadiisa aan
maanta idinku amrayo. 11 Oo isla maalintaas Muuse wuxuu
dadkii ku amray oo ku yidhi, 12 Reer Simecoon, iyo reer
Laawi, iyo reer Yahuudah, iyo reer Isaakaar, iyo reer Yuusuf,
iyo reer Benyaamiin waa inay kor istaagaan Buur Gerisiim
inay dadka u duceeyaan markaad Webi Urdun ka gudubtaan.
13 Oo reer Ruubeen, iyo reer Gaad, iyo reer Aasheer, iyo reer
Sebulun, iyo reer Daan, iyo reer Naftaalina waa inay Buur
Ceebaal habaar isla taagaan. 14 Oo markaas reer Laawi
waa inay jawaabaan oo dadka reer binu Israa'iil oo dhan
cod weyn ku yidhaahdaan, 15 Inkaaru ha ku dhacdo ninkii
sameeya oo meel qarsoon qotonsada sanam xardhan ama
la shubay oo Rabbiga karaahiyo u ah oo ah wax nin saanac

ahu gacantiisa ku sameeyey. Oo dadka oo dhammuna
ha u jawaabeen oo ha yidhaahdeen, Aamiin. **16** Inkaaru
ha ku dhacdo kii aabbihiis ama hooyadiis fududaysta. Oo
dadka oo dhammuna ha yidhaahdeen, Aamiin. **17** Inkaaru
ha ku dhacdo kii soohdinta deriskiisa durkiya. Oo dadka
oo dhammuna ha yidhaahdeen, Aamiin. **18** Inkaaru ha
ku dhacdo kii qof indha la' jidka ka habaabiya. Oo dadka
oo dhammuna ha yidhaahdeen, Aamiin. **19** Inkaaru ha
ku dhacdo kii qalloociya garta qariibka iyo agoonta iyo
carmalka. Oo dadka oo dhammuna ha yidhaahdeen, Aamiin.
**20** Inkaaru ha ku dhacdo kii la seexda naagtii aabbihiis,
maxaa yeelay, aabbihiis buu maradii ka banneeyey. Oo
dadka oo dhammuna ha yidhaahdeen, Aamiin. **21** Inkaaru ha
ku dhacdo kii neef u galmooda, cayn kasta ha ahaadee. Oo
dadka oo dhammuna ha yidhaahdeen, Aamiin. **22** Inkaaru ha
ku dhacdo kii la seexda walaashiis oo ah ina aabbihiis ama
ina hooyadiis. Oo dadka oo dhammuna ha yidhaahdeen,
Aamiin. **23** Inkaaru ha ku dhacdo kii soddohdiis la seexda.
Oo dadka oo dhammuna ha yidhaahdeen, Aamiin. **24** Inkaaru
ha ku dhacdo kii deriskiisa qarsoodi ku dila. Oo dadka
oo dhammuna ha yidhaahdeen, Aamiin. **25** Inkaaru ha ku
dhacdo kii laaluush u qaata inuu qof aan xaq qabin dilo. Oo
dadka oo dhammuna ha yidhaahdeen, Aamiin. **26** Inkaaru
ha ku dhacdo ku kasta oo aan adkayn sharcigan erayadiisa
inuu sameeyo. Oo dadka oo dhammuna ha yidhaahdeen,
Aamiin.

**28** Oo haddaad aad u dhegaysataan codka Rabbiga
Ilaahiinna ah, oo intaad xajisaan aad yeeshaan
amarradiisa aan maanta idinku amrayo oo dhan, Rabbiga
Ilaahiinna ahu wuxuu idinka wada sare marin doonaa
quruumaha dunida oo dhan. **2** Oo barakooyinkan oo
dhammuna way idinku soo degi doonaan, wayna idin
soo gaadhi doonaan, haddaad codka Rabbiga Ilaahiinna
ah dhegaysataan. **3** Waxaad ku barakaysnaan doontaan
magaalada, oo waxaad ku barakaysnaan doontaan duurka.
**4** Oo waxaa barakaysnaan doona midhaha jidhkiinna, iyo
midhaha dhulkiinna, iyo midhaha xoolihiinna oo ah dhasha
lo'diinna iyo tan idihiinna. **5** Waxaa barakaysnaan doona
dambiishiinna iyo weelkiinna aad wax ku cajiintaan. **6**
Oo waad barakaysnaan doontaan markaad gudaha soo
gashaan, oo waad barakaysnaan doontaan markaad dibadda
u baxdaan. **7** Oo cadaawayaashiinna idinku kaca Rabbigu
wuxuu ka dhigi doonaa in hortiinna lagu laayo. Jid qudha
ayay idinkaga iman doonaan, oo hortiinna ayay toddoba jid
ku kala carari doonaan. **8** Oo Rabbigu wuxuu ku amri doonaa
inay barakadu idinku soo degto idinka, iyo maqsinnadiinna,
iyo wax alla wixii aad gacanta ku qabataanba, oo wuxuu
idinku barakayn doonaa dalka Rabbiga Ilaahiinna ahu
uu idin siinayo. **9** Rabbigu wuxuu idinka dhigan doonaa
dad isaga qudhiisa quduus u ah, siduu idiinku dhaartay,
haddaad amarrada Rabbiga Ilaahiinna ah xajisaan oo
aad jidadkiisana ku socotaan. **10** Oo dadka dunida oo
dhammu waxay arki doonaan in laydiinku yeedhay magicii
Rabbiga, wayna idinka cabsan doonaan. **11** Oo Rabbigu
wanaag buu idiinku badin doonaa midhaha jidhkiinna,
iyo midhaha xoolihiinna, iyo midhaha dhulkiinna idinkoo
jooga dalka Rabbigu awowayaashiin ugu dhaartay inuu idin
siinayo. **12** Oo Rabbigu wuxuu idiin furi doonaa khasnaddiisa
wanaagsan ee samada inuu dalkiinna roob siiyo xilligiisa, iyo
inuu wada barakeeyo shuqulka aad gacanta ku qabataan
oo dhan, oo idinku quruumo badan baad wax deymin
doontaan, waxbase ma amaahan doontaan. **13** Oo Rabbigu
wuxuu idinka dhigayaa madaxa, idinkana dhigi maayo
dabada, oo weligiin waxaad ahaanaysaan kuwa sarreeya,
oo noqon maysaan kuwa hooseeya, haddaad dhegaysataan
amarrada Rabbiga Ilaahiinna ah oo aan maanta idinku
amrayo, oo intaad xajisaan aad yeeshaan, **14** oo aydaan
erayada aan maanta idinku amrayo gees uga leexan xagga
midigta iyo xagga bidixda toona, inaad ilaahyo kale daba
gashaan oo aad u adeegtaan. **15** Laakiinse haddaydnan
dhegaysan codka Rabbiga Ilaahiinna ah, inaad xajisaan oo
aad wada yeeshaan amarradiisa iyo qaynuunnadiisa aan
maanta idinku amrayo, markaas inkaarahan oo dhammu
way idinku soo degi doonaan oo idin soo gaadhi doonaan.
**16** Waxaad ku inkaarnaan doontaan magaalada oo waxaad
ku inkaarnaan doontaan duurka. **17** Waxaa inkaarnaan
doona dambiishiinna iyo weelkiinna aad wax ku cajiintaan.
**18** Oo waxaa inkaarnaan doona midhaha jidhkiinna iyo
midhaha dhulkiinna, iyo dhasha lo'diinna iyo tan idihiinna.
**19** Oo waad inkaarnaan doontaan markaad gudaha soo
gashaan, oo waad inkaarnaan doontaan markaad dibadda u
baxdaan. **20** Rabbigu wuxuu idinku soo dejin doonaa inkaar
iyo dhibaato, oo wuu idinku canaanan doonaa wax alla wixii
aad gacanta ku qabataan oo dhan jeeraad baabba'daan
oo aad haddiiba halligantaan, waana sharka falimihiinna,
oo aad iiga tagteen aawadiis. **21** Oo Rabbigu wuxuu idinku
dhejin doonaa balaayada, jeeruu idinka baabbi'iyo dalka aad
u gelaysaan inaad hantidaan. **22** Rabbiguna wuxuu idinku
dhufan doonaa taagdarro, iyo qandho, iyo gubasho, iyo
kulayl daran, iyo seef, iyo beera-engeeg, iyo caariyaysi, oo
iyana way idin eryan doonaan ilaa aad halligantaan. **23** Oo
samada idinka korraysaa waxay noqon doontaa naxaas, oo
dhulka idinka hooseeyaana wuxuu noqon doonaa bir. **24** Oo

Rabbigu roobka dalkiinna wuxuu ka dhigi doonaa budo iyo
boodh, oo waxaasu samaday idinkaga soo degi doonaan ilaa
aad baabba'daan. 25 Oo Rabbigu wuxuu ka dhigi doonaa
in laydinku laayo cadaawayaashiinna hortooda, oo iyaga
jid qudha baad kaga iman doontaan, oo hortooda ayaad
toddoba jid ku kala carari doontaan, oo boqortooyooyinka
dunida oo dhammu waad ku dhex rogrogmi doontaan hore
iyo dib. 26 Oo meydkiinnu wuxuu cunto u noqon doonaa
haadka hawada oo dhan iyo dugaagga dhulka, oo mid iyaga
ka eryana lama arki doono. 27 Oo Rabbigu wuxuu idinku ridi
doonaa boogtii Masar, iyo kasoobaxyo, iyo cadho, iyo xajiin
aydaan ka bogsan karin. 28 Oo weliba Rabbigu wuxuu idinku
ridi doonaa waalli iyo indhabbeel iyo naxdin. 29 Oo hadhkii
baad u haabhaaban doontaan sida indhooluhu gudcurka
u haabhaabto, oo jidadkiinna kuma liibaani doontaan,
laakiinse had iyo goorba waa laydin dulmi doonaa oo
waa laydin dhici doonaa, oo mid idin badbaadiyana lama
arki doono. 30 Naag baad guursan doontaa, laakiinse
nin kalaa la seexan doona, guri baad dhisan doontaa,
laakiinse degi maysid, beercanab baad beeran doontaa,
laakiinse midhihiisa ku isticmaali maysid. 31 Dibigaaga ayaa
hortaada lagu gowrici doono, idahaagana waxaa la siin
doonaa cadaawayaashaada, oo mid ku badbaadiyana lama
arki doono. 32 Wiilashiinna iyo gabdhihiinna waxaa la siin
doonaa dad kale, oo indhihiinnuna way eegi doonaan, oo
maalinta oo dhan waxaad la taag darnaan doontaan xiiso
aad iyaga u qabtaan, oo gacantiinnuna xoog ma yeelan
doonto innaba. 33 Oo midhaha dhulkiinna iyo hawshiinna oo
dhan waxaa cuni doona quruun aydaan aqoon, oo weligiin
waxaad ahaan doontaan dad la dulmo oo la burburiyo,
34 oo taas daraaddeed waxaad la waalan doontaan waxa
indhihiinnu arki doonaan. 35 Oo Rabbigu lowyaha iyo
lugaha tan iyo tin iyo cedhib wuxuu idinka gelin doonaa
boogo aydaan ka bogsan karin. 36 Oo Rabbigu wuxuu
idinka iyo boqorkiinna aad boqran doontaanba u geeyn
doonaa quruun idinka iyo awowayaashiinba aydaan aqoon,
oo halkaas waxaad ugu adeegi doontaan ilaahyo kale oo
qoryo iyo dhagax ah. 37 Oo dadyowga Rabbigu idiin geeyn
doono oo dhan dhexdooda waxaad ku ahaan doontaan
yaab iyo maahmaah iyo halqabsi. 38 Waxaad beerta u
qaadan doontaan abuur badan, wax yar baadse ka soo
urursan doontaan, maxaa yeelay, waxaa cuni doona ayax.
39 Waxaad beeran doontaan beero canab ah, waanad fali
doontaan, laakiinse khamrina ma cabbi doontaan, canabna
kama guran doontaan, waayo, waxaa cuni doona dixiri.
40 Oo soohdimihiinna oo dhan dhexdooda waxaa idiinku
oolli doona geedo saytuun ah, laakiinse saliid kuma subkan
doontaan, waayo, saytuunkiinna midhuhu way ka daadan
doonaan. 41 Waxaad dhali doontaan wiilal iyo gabdho,
laakiinse iyagu kuwiinna ma ahaan doonaan, maxaa yeelay,
maxaabiis ahaan bay idiinka tegi doonaan. 42 Dhirtiinna
oo dhan iyo midhaha dhulkiinnaba waxaa lahaan doona
ayax. 43 Oo qariibka dhexdiinna ku jira ayaa idinka sare mari
doona, oo idinkuna hoos baad u sii degi doontaan. 44 Oo
isagu wax buu idin deymin doonaa, idinkuse wax ma deymin
doontaan, madaxa buu noqon doonaa, idinkuse dabada
baad noqon doontaan. 45 Inkaarahan oo dhammu idinkay
idinku soo degi doonaan, wayna idin eryan doonaan oo idin
soo gaadhi doonaan ilaa aad baabba'daan, maxaa yeelay,
ma aydaan dhegaysan codka Rabbiga Ilaahiinna ah, inaad
xajisaan amarradiisa iyo qaynuunnadiisa uu idinku amray. 46
Oo waxay calaamad iyo yaab ku dul ahaan doonaan idinka
iyo farcankiinnaba weligiin, 47 maxaa yeelay, idinku Rabbiga
Ilaahiinna ah wax kasta oo uu idinku badiyey aawadood
uguguma aydaan adeegin faraxsanaan iyo qalbi reyreeya.
48 Haddaba sidaas daraaddeed cadaawayaashiinna Rabbigu
idiin soo diri doono ayaad ugu adeegi doontaan gaajo iyo
harraad iyo qaawanaan, idinkoo wax kasta u baahan, oo
wuxuu qoorta idinka saari doonaa harqood bir ah, ilaa uu
idin baabbi'iyo. 49 Rabbigu wuxuu meel fog oo dhulka
darafkiisa ah idinkaga keeni doonaa quruun sida gorgorka u
duulaysa oo aydaan afkeeda garanayn, 50 oo ah quruun
weji cabsi badan, oo aan dadka waayeelka ah maamuusin,
aan dhallaankana u nixin. 51 Oo dadkaasu wuxuu cuni
doonaa midhaha xoolihiinna iyo midhaha dhulkiinna, ilaa aad
baabba'daan, oo weliba idiinkama tegi doono hadhuudh,
iyo khamri, iyo saliid, iyo dhasha lo'diinna, iyo tan idihiinna,
ilaa uu idin halligo. 52 Oo meel kasta oo dhulkiinna ah
ayuu dhammaan irdihiinna idinku hareerayn doonaa ilaa
derbiyadiinna deyrka dheer ee aad isku hallayseen ay soo
wada dhacaan, oo wuxuu idinku hareerayn doonaa irdihiinna
oo dhan ee dhulka Rabbiga Ilaahiinna ahu uu idin siiyey
oo dhan. 53 Oo waxaad cuni doontaan midhaha jidhkiinna,
kaasoo ah hilibka wiilashiinna iyo gabdhihiinna Rabbiga
Ilaahiinna ahu uu idin siiyey, waana markaad gashaan
hareeraynta iyo cidhiidhiga ay cadaawayaashiinnu idinku
cidhiidhin doonaan. 54 Ninka idinku dhex jira oo idiinku
jilicsan, oo qabow ku noolaan jiray, wuxuu il shar ah ku
dayi doonaa walaalkiis, iyo naagtiisa laabta kaga jiifta,
iyo kuwa carruurtiisa ka hadhay, 55 si uusan midkoodna
wax uga siin hilibka carruurtiisa oo uu cuni doono, maxaa
yeelay, isaga waxba uma hadhi doonaan intii uu ku jiro
hareeraynta iyo cidhiidhiga ay cadaawayaashiinnu irdihiinna
oo dhan idinkaga cidhiidhin doonaan. 56 Oo naagta jilicsan,

oo idinku dhex jirta oo qabow ku noolaan jirtay oo aan
u quudhin inay cagteeda cad dhulka dhigto nolosheedii
qaboobayd oo jilicsanayd aawadeed, waxay il shar ah ku
dayi doontaa ninkeeda laabta kaga jiifa, iyo wiilkeeda iyo
gabadheeda. 57 Wayna ka qarsan doontaa mandheerta
ka soo dhex baxdo labadeeda lugood, iyo carruurteeda
ay dhasho, waayo, qarsoodi bay iyaga u cuni doontaa
iyadoo wax kasta u baahan, intay ku jirto hareeraynta
iyo cidhiidhiga ay cadaawayaashiinnu irdihiinna oo dhan
idinkaga cidhiidhin doonaan. 58 Haddeydnan dhawrin oo
wada yeelin erayada sharcigan ee kitaabkan ku qoran
oo dhan inaad ka cabsataan magacan ammaanta badan
oo cabsida badan oo ah RABBIGA ILAAHIINNA AH, 59
markaas Rabbigu wuxuu idinka iyo farcankiinnaba ku ridi
doonaa belaayooyin yaab leh oo waaweyn oo wakhti dheer
idinku raaga, iyo cudurro xunxun oo wakhti dheer idinku
raaga, iyo cudurro xunxun oo wakhti dheer idinku raaga.
60 Oo haddana wuxuu idinku soo dejin doonaa cudurradii
Masar oo dhan oo aad ka cabsan jirteen, oo way idinku
dhegi doonaan. 61 Oo weliba Rabbigu wuxuu kaloo idinku
soo dejin doonaa ilaa aad wada baabba'daan cudur kasta
iyo belaayo kasta oo aan ku qornayn kitaabka sharcigan.
62 Oo in kastoo aad u faro badnaydeen sida xiddigaha
samada oo kale waxaa uun idinka hadhi doona in yar oo
dhawr ah, maxaa yeelay, codkii Rabbiga Ilaahiinna ah ayaad
dhegaysan weydeen. 63 Oo sidii Rabbigu idiinku farxay inuu
wanaag idiin sameeyo oo uu idin badiyo, ayuu sidaas oo kale
ugu farxi doonaa inuu idin halligo oo idin baabbi'iyo, oo idinka
waa laydinka rujin doonaa dalka aad ugu socotaan inaad
hantidaan. 64 Oo Rabbigu wuxuu idinku kala dhex firdhin
doonaa dadyowga oo dhan, iyo tan iyo dunida geesteed
iyo ilaa geesteeda kale, oo halkaas waxaad ugu adeegi
doontaan ilaahyo kale oo qoryo iyo dhagax ah oo aydaan
aqoon idinka iyo awowayaashiin toona. 65 Oo quruumahaas
dhexdooda istareex kama heli doontaan, oo cagtiinnuna
ma nasan doonto, laakiinse Rabbigu wuxuu halkaas idinku
siin doonaa qalbigariir, iyo indhabbeel, iyo naf dulloobid. 66
Oo naftiinnana waad u shakiyi doontaan, oo habeen iyo
maalinba waad cabsan doontaan, oo noloshiinnana ma aad
hubi doontaan innaba. 67 Oo waaberigii waxaad odhan
doontaan, Bal may fiid noqoto! Sababtuna waa cabsida aad
qalbiga ka cabsan doontaan iyo xumaanta aad indhaha ku
arki doontaan. 68 Oo Rabbigu mar dambe wuxuu Masar
idinku celin doonaa idinkoo doonniyo ku jira, oo waxaad
mari doontaan jidkii aan idinku idhi, Mar dambe ma aad arki
doontaan, oo halkaasaad cadaawayaashiinna isugu iibin
doontaan, inaad rag iyo dumarba addoommo u ahaataan, oo
weliba ninna idinma iibsan doono.

29 Kuwanu waa erayadii axdigii Rabbigu Muuse ku amray,
oo uu reer binu Israa'iil kula dhigtay dalkii reer Moo'aab,
oo aan ahayn axdigii uu iyaga kula dhigtay Buur Xoreeb. 2
Markaasaa Muuse u wada yeedhay reer binu Israa'iil oo
dhan, oo wuxuu ku yidhi, Idinku waad wada aragteen wixii
Rabbigu markaad Masar joogteen hortiinna ku sameeyey
Fircoon iyo addoommadiisii oo dhan iyo dalkiisii oo dhan,
3 kuwaas oo ahaa jirrabyadii waaweynaa oo indhihiinnu
arkeen, iyo calaamooyinkii iyo yaababkii waaweynaa, 4
laakiinse Rabbigu ilaa maantadan la joogo idinma siin qalbi
wax garta iyo indho wax arka iyo dhego wax maqla toona. 5
Oo anigu intii afartan sannadood ah ayaan cidlada idinku
dhex kexeeyey, oo dharkiinnii korkiinna kuma duugoobin,
kabihiinniina cagihiinna kuma dhammaanin. 6 Idinku ma
aydaan cunin kibis, mana aydaan cabbin khamri ama wax
lagu sakhraamo toona si aad u garataan inaan anigu ahay
Rabbiga Ilaahiinna ah. 7 Oo markaad meeshan timaadeen
waxaa inagu soo baxay Siixon oo ahaa boqorkii Xeshboon
iyo Coog oo ahaa boqorkii Baashaan, oo innana waynu
laynay. 8 Oo dalkoodiina intaan qaadannay ayaan dhaxal u
siinnay reer Ruubeen iyo reer Gaad iyo qabiilkii reer Manaseh
badhkood. 9 Haddaba erayada axdigan xajiya oo yeela inaad
ku liibaantaan wax alla wixii aad samaysaan. 10 Maanta
dhammaantiin waxaad hor taagan tihiin Rabbiga Ilaahiinna
ah. Waxaa wada jooga madaxdiinnii, iyo qabiilooyinkiinnii,
iyo odayaashiinnii, iyo saraakiishiinnii, iyo xataa nimankii reer
binu Israa'iil oo dhan, 11 iyo dhallaankiinnii, iyo naagihiinnii,
iyo qariibkiinnii xeryihiinna ku dhex jira, xataa kan geedaha
idiin jara iyo kan biyaha idiin dhaansha, 12 inaad gashaan
axdiga Rabbiga Ilaahiinna ah iyo dhaarta Rabbiga Ilaahiinna
ahu uu maanta idinla dhiganayo, 13 inuu maanta dad idinka
dhigto iyo inuu Ilaah idiin noqdo, siduu idiin sheegay oo uu
ugu dhaartay awowayaashiin oo ahaa Ibraahim iyo Isxaaq
iyo Yacquub. 14 Oo idinka keligiinna idinla dhigan maayo
axdigan iyo dhaartan, 15 laakiinse waxaan la dhiganayaa ka
maanta inala taagan halkan Rabbiga Ilaaheenna ah hortiisa,
iyo ka aan maanta halkan inala taagnaynba, 16 (waayo,
waad ogtihiin sidaan Masar ku dhex degganaan jirnay iyo
sidaan u soo dhex marnay quruumihii aad ka soo dhex
gudubteen, 17 waanad aragteen waxyaalahoodii karaahiyada
ahaa iyo sanamyadoodii ahaa qoryaha, iyo dhagaxa, iyo
lacagta, iyo dahabka, oo iyaga dhex yiil, ) 18 waaba intaasoo
uu dhexdiinna ku jiraa nin, ama naag, ama reer, ama qabiil,
qalbigiisu maanta uga sii jeestay Rabbiga Ilaaheenna ah inuu

u adeego quruumahaas ilaahyadooda, oo waaba intaasoo
uu idinku dhex jiraa xidid dhalaa xammeeti iyo dacar, 19 oo
ay noqon doontaa markuu maqlo habaarkan erayadiisa inuu
isagu qalbigiisa ka ducaysto oo isyidhaahdo, Nabad baan
heli doonaa, in kastoo aan ku socday madaxadayggayga
inaan sakhraannimo ku harraadbeelo. 20 Rabbigu ninkaas
saamixi maayo, laakiinse Rabbiga cadhadiisa iyo masayrkiisa
ayaa ninkaas ku kululaan doona, oo inkaarta kitaabkan
ku qoran oo dhammuna isagay saarnaan doontaa, oo
Rabbiguna magiciisa wuu ka tirtiri doonaa inta samada ka
hoosaysa oo dhan. 21 Oo Rabbigu wuxuu isaga qabiilooyinka
reer binu Israa'iil oo dhan uga dhex sooci doonaa inuu
belaayo ugu dejiyo siday yihiin dhammaan inkaaraha
axdiga ee ku qoran kitaabkan sharciga. 22 Oo qarniga
soo socda oo ah carruurtiinna dabadiin kici doonta, iyo
shisheeyaha dal fog ka iman doonaaba markay arkaan
dalkaas belaayadiisa iyo cudurrada Rabbigu ku riday, 23 iyo
in dalka oo dhammu yahay baaruud, iyo cusbo, iyo meel
guban, oo aan waxba lagu beerin, aanna dhalin, oo aan
cawsna ka bixin innaba sidii markii la afgembiyey Sodom iyo
Gomora, iyo Admaah iyo Seboyim oo Rabbigu ku afgembiyey
cadhadiisa iyo xanaaqiisa, 24 markaasay quruumaha oo
dhammu odhan doonaan, Rabbigu muxuu dalkan sidaas
ugu galay? Oo kulaylka xanaaqan weyn micnihiisu waa
maxay? 25 Markaasaa dadku waxay odhan doonaan, Maxaa
yeelay, iyagu waxay ka tageen axdigii uu Rabbiga ah Ilaaha
awowayaashood la dhigtay markuu ka soo bixiyey dalkii
Masar, 26 oo intay tageen ayay u adeegeen oo caabudeen
ilaahyo kale oo ayan aqoon, isaguna uusan siin, 27 oo sidaas
daraaddeed ayaa Rabbigu ugu xanaaqay dalkan, inuu ku
soo dejiyo kulli inkaarta kitaabkan ku qoran oo dhan. 28 Oo
Rabbigu dhulkoodii ayuu kaga rujiyey cadho iyo xanaaq
iyo dhirif weyn, oo wuxuu ku dhex tuuray dal kaleeto siday
maantadan tahay. 29 Waxyaalaha qarsoon waxaa iska leh
Rabbiga Ilaaheenna ah, laakiinse waxyaalaha la muujiyey
waxaa iska leh innaga iyo carruurteenna weligeenba inaan
sharcigan erayadiisa oo dhan yeelno.

**30** Oo markii waxyaalahan oo dhammu ay idinku dhacaan,
kuwaas oo ah barakada iyo inkaarta aan idin hor dhigay,
oo aad ku xusuusataan quruumaha Rabbiga Ilaahiinna
ahu uu idinku kexeeyey dhexdooda oo dhan, 2 oo aad
Rabbiga Ilaahiinna ah u soo noqotaan oo aad idinka iyo
carruurtiinnuba qalbigiinna oo dhan iyo naftiinna oo dhan ku
addeecdaan codkiisa iyo waxyaalahan aan maanta idinku
amrayo oo dhan, 3 markaasaa Rabbiga Ilaahiinna ahu idinka
celin doonaa maxaabiisnimadiinna, wuuna idiin naxariisan
doonaa, oo mar kaluu idinka soo ururin doonaa quruumihii
Rabbiga Ilaahiinna ahu uu dhexdooda idinku kala firdhiyey
oo dhan. 4 Oo haddii masaafirradiinna qaarkoodu joogaan
meesha samada ugu shishaysa, Rabbiga Ilaahiinna ahu
halkaasuu idinka soo ururin doonaa, oo halkaasuu idinka soo
kaxayn doonaa, 5 markaasaa Rabbiga Ilaahiinna ahu wuxuu
idin keeni doonaa dalkii awowayaashiin mar hore hantiyeen,
oo idinna waad hantiyi doontaan, oo wanaag buu idiin samayn
doonaa, wuuna idinka sii badin doonaa intii awowayaashiin
ahaan jireen. 6 Oo markaas Rabbiga Ilaahiinna ahu sida
jidhka loo gudo ayuu idinka jari doonaa xumaanta qalbigiinna
iyo tan qalbiga farcankiinna inaad Rabbiga Ilaahiinna ah
ka jeclaataan qalbiga oo dhan iyo nafta oo dhan si aad u
noolaataan. 7 Oo Rabbiga Ilaahiinna ahu inkaarahan oo
dhan wuxuu ku ridi doonaa cadaawayaashiinna iyo kuwa
idin neceb oo idin silcin jiray. 8 Oo idinna waa inaad soo
noqotaan, oo aad addeecdaan codka Rabbiga, oo aad
yeeshaan amarradiisa aan maanta idinku amrayo oo dhan.
9 Oo Rabbiga Ilaahiinna ahu wuxuu idinku barwaaqayn
doonaa shuqulka aad gacanta ku qabataan oo dhan iyo
midhaha jidhkiinna iyo midhaha xoolahiinna, iyo midhaha
dhulkiinnaba, waayo, Rabbigu mar kaluu ku farxi doonaa
inuu wanaag idiin sameeyo siduu awowayaashiin ugu farxay
oo kale, 10 haddaad addeecdaan codka Rabbiga Ilaahiinna
ah oo aad xajisaan amarradiisa iyo qaynuunnadiisa ku
qoran kitaabkan sharciga, iyo haddaad Rabbiga Ilaahiinna
ah ugu soo noqotaan qalbiga oo dhan iyo nafta oo dhan.
11 Waayo, amarkan aan maanta idinku amrayo ma aha
mid aad idiinku adag, mana aha mid idinka fog. 12 Oo
samadana kuma uu jiro si aad u tidhaahdaan, Bal yaa
samada noo kori doona oo noo keeni doona, oo na maqashiin
doona aannu amarkaas yeelnee? 13 Oo baddana kama
uu shisheeyo si aad u tidhaahdaan, Bal yaa badda nooga
gudbi doona oo noo keeni doona, oo na maqashiin doona,
aannu amarkaas yeelnee? 14 Laakiinse eraygii waa idiin
dhow yahay, wuxuuna ku jiraa afkiinna iyo qalbigiinna inaad
yeeshaan. 15 Bal eega, maanta waxaan idin hor dhigay nolol
iyo wanaag, iyo geeri iyo shar, 16 oo waxaan maanta idinku
amrayaa inaad Rabbiga Ilaahiinna ah jeclaataan, oo aad
jidadkiisa ku socotaan, oo aad wada xajisaan amarradiisa
iyo qaynuunnadiisa iyo xukummadiisa inaad noolaataan oo
badataan iyo in Rabbiga Ilaahiinna ahu idinku barakeeyo
dalka aad ugu socotaan inaad hantidaan. 17 Laakiinse
haddii qalbigiinnu sii jeesto, oo aad dhegaysan weydaan,
laakiinse laydiin jiito inaad ilaahyo kale caabuddaan oo u
adeegtaan, 18 waxaan maanta idiin caddaynayaa inaad
hubaal halligmaysaan, oo cimrigiinnu ku dheeraan maayo
dalka aad Webi Urdun uga gudbaysaan inaad gashaan oo

aad hantidaan. 19 Maanta waxaan u yeedhayaa samada
iyo dhulka inay idiinku markhaati furaan, inaan idin hor
dhigay nolol iyo geeri, iyo barako iyo inkaar, haddaba sidaas
daraaddeed nolosha doorta idinka iyo farcankiinnuba aad
noolaateene, 20 idinkoo Rabbiga Ilaahiinna ah jecel, oo
codkiisa addeecaya, oo isaga sii xajista, waayo, isagu waa
noloshiinna iyo dhererka cimrigiinna inaad degganaataan
dalkii Rabbigu ugu dhaartay inuu siinayo awowayaashiin oo
ahaa Ibraahim, iyo Isxaaq, iyo Yacquub.

**31** Markaasaa Muuse tegey oo erayadan kula hadlay
reer binu Israa'iil oo dhan. 2 Oo wuxuu iyagii ku yidhi,
Maanta waxaan jiraa boqol iyo labaatan sannadood, oo mar
dambe ma bixi karo, mana soo geli karo, oo Rabbiguna
wuxuu igu yidhi, Webigan Urdun ka gudbi maysid. 3 Haddaba
waxaa idin hor gudbaya Rabbiga Ilaahiinna ah, oo hortiinna
buu ka baabbi'in doonaa quruumahaas, oo idinna iyaga
waad hantiyi doontaan, oo sidii Rabbigu yidhi, waxaa idin hor
kici doona Yashuuca. 4 Oo Rabbigu wuxuu quruumahaas ku
samayn doonaa siduu ugu sameeyey Siixon iyo Coog iyo
dalkoodiiba, kuwaas oo ahaa boqorradii reer Amor ee uu
baabbi'iyey. 5 Oo Rabbigu iyaga gacantiinna buu soo gelin
doonaa, oo waa inaad ku samaysaan siduu yahay amarkii
aan idinku amray oo dhan. 6 Haddaba xoog yeesha oo aad u
dhiirranaada, ha baqina, hana ka cabsanina, waayo, waxaa
idinla socda Rabbigii Ilaahiinna ahaa. Idinma gabi doono,
idinmana dayrin doono. 7 Markaasaa Muuse Yashuuca u
yeedhay, oo wuxuu reer binu Israa'iil oo dhan hortooda
ku yidhi, Xoog yeelo oo aad u dhiirranow, waayo, waxaad
dadkan ula gudbaysaa dalkii Rabbigu awowayaashood ugu
dhaartay inuu iyaga siinayo, oo dalkaas ayaad dhaxalsiin
doontaa. 8 Waxaa ku hor socda Rabbiga, wuuna kula jiri
doonaa, kuma gabi doono, kumana dhayrin doono, haddaba
ha baqin, hana qalbi jabin. 9 Markaasaa Muuse sharcigan
qoray, oo wuxuu u dhiibay wadaaddadii reer Laawi oo qaadi
jiray sanduuqii axdiga Rabbiga, iyo odayaashii reer binu
Israa'iil oo dhan. 10 Markaasaa Muuse iyagii ku amray oo ku
yidhi, Haddaba markii toddoba sannadood dhammaatoba
wakhtiga la amray oo sannadda saamaxaadda, oo ah Iidda
Waababka, 11 markii reer binu Israa'iil oo dhammu ay u
yimaadaan inay Rabbiga Ilaahiinna ah kaga hor muuqdaan
meesha uu dooranayo, waa inaad sharcigan ku akhridaan
reer binu Israa'iil oo dhan hortooda iyagoo maqlaya. 12 Oo
soo wada shiriya dadka oo dhan, ragga, iyo dumarka, iyo
dhallaanka, iyo qariibka irdihiinna ku jiraba, inay maqlaan,
oo ay bartaan, oo ay Rabbiga Ilaahiinna ah ka cabsadaan,
iyo inay xajiyaan oo wada yeelaan erayada sharcigan oo
dhan, 13 iyo in carruurtooda aan hore u aqoonu ay maqlaan,
oo ay bartaan inay Rabbiga Ilaahiinna ah ka cabsadaan,
in alla intaad deggan tihiin dalka aad Webi Urdun uga
gudbaysaan inaad hantidaan. 14 Markaasaa Rabbigu Muuse
ku yidhi, Bal eeg, wakhtigii aad dhiman lahayd waa soo
dhow yahay, haddaba Yashuuca u yeedh oo isdhex taaga
teendhada shirka, aan isaga amar siiyee. Markaasaa Muuse
iyo Yashuuca tageen oo teendhadii shirka isdhex taageen.
15 Kolkaasaa Rabbigu teendhada kaga dhex muuqday tiir
daruur ah, oo tiirkii daruurta ahaa wuxuu ku kor istaagay
iriddii teendhada. 16 Markaasaa Rabbigu Muuse ku yidhi,
Bal eeg, waad dhiman doontaa oo awowayaashaa la seexan
doontaa, oo dadkanuna way kici doonaan oo sida naagi
ninkeeda ka dhillowday ayay u raaci doonaan ilaahyada
qalaad ee dalka, kuwaasoo ay dhex joogayaan, oo aniga way
iga tegi doonaan oo axdigaygii aan iyaga la dhigtayna way
jebin doonaan. 17 Oo kolkaasaa cadhadaydu ku kululaan
doontaa iyaga, waanan ka tegi doonaa, oo wejigaygana
waan ka qarin doonaa, oo iyaga waa la baabbi'in doonaa,
oo waxaa ku soo degi doona masiibo iyo dhibaatooyin
badan, oo waxay maalintaas odhan doonaan, Ilaaheenna
aan ina dhex joogin aawadiis sow masiibadanu inooguma
soo degin? 18 Oo anna hubaal maalintaas wejigayga ayaan
ka qarin doonaa sharka badan oo ay sameeyeen aawadiis,
maxaa yeelay, iyagu waxay u jeesteen ilaahyo kale. 19
Haddaba gabaygan qorta, adiguna reer binu Israa'iil bar,
oo iyaga afkooda geli, in gabaygaasu ii noqdo markhaati
reer binu Israa'iil ka gees ah. 20 Waayo, markaan iyaga
geeyo dalkii aan awowayaashood ugu dhaartay, dalkaasoo
caano iyo malab la barwaaqaysan, oo ay wax cunaan oo
wada dhergaan oo cayilaan, kolkaasay u jeesan doonaan
ilaahyo kale, wayna u adeegi doonaan, anna way i quudhsan
doonaan, axdigaygana way jebin doonaan. 21 Oo markii
masiibo iyo dhibaatooyin badanu ku soo degaan ayaa
gabayganu hortooda ku markhaati furayaa, waayo, afka
farcankoodu ma illoobi doono, maxaa yeelay, waan ogahay
fikirkooda ay ku fikirayaan haddeertan intaanan iyaga geeyn
dalkii aan ugu dhaartay ka hor. 22 Sidaas daraaddeed
Muuse ayaa gabaygan isla maalintaas qoray oo reer binu
Israa'iil baray. 23 Oo Rabbigaa Yashuuca ina Nuun amar
siiyey oo ku yidhi, Xoog yeelo oo aad u dhiirranow, waayo,
reer binu Israa'iil ayaad geeyn doontaa dalkii aan iyaga ugu
dhaartay, oo anna waan kula jiri doonaa. 24 Oo markii Muuse
dhammaystiray sharcigan erayadiisii oo uu kitaab ku qoray
ilaa ay wada dhammaadeen, 25 ayaa Muuse amray reer
Laawi oo qaadi jiray sanduuqii axdiga Rabbiga, oo wuxuu
ku yidhi iyagii, 26 Kitaabkan sharciga qaada, oo waxaad
ag dhigtaan sanduuqa axdiga Rabbiga Ilaahiinna ah inuu

halkaas ku ahaado markhaati idinka gees ah. **27** Waayo,
caasinimadiinna iyo madax adkaantiinna waan aqaan. Bal
eeg, intaan weli noolahay oo aan maantadan idinla joogo
caasiyiin baad ku ahaydeen Rabbiga, haddaba intee baad
ka sii darnaan doontaan markaan dhinto dabadeed? **28**
Haddaba bal ii soo shiriya odayaasha qabiilooyinkiinna oo
dhan iyo saraakiishiinna aan erayadan dhegahooda kula
hadlee, oo aan samada iyo dhulkana u yeedha iyaga ha
ku marag fureene. **29** Waayo, waan ogahay in markaan
dhinto dabadeed aad iskharribi doontaan, oo aad jidkii
aan idinku amrayna gees uga leexan doontaan, oo ugu
dambaystana masiibo baa idinku dhici doonta, maxaa yeelay,
waxaad samayn doontaan wax Rabbiga hortiisa shar ku ah,
inaad isaga kaga xanaajisaan shuqulka aad gacmihiinna ku
samaysaan. **30** Kolkaasaa Muuse shirkii reer binu Israa'iil oo
dhan dhegahoodii kula hadlay erayadii gabaygan ilaa ay
wada dhammaadeen.

**32** Samooyinkow, dhegaysta waan hadlayaaye, Oo
dhulkuna ha maqlo erayada afkayga. **2** Cilmigaygu
wuxuu u soo da'ayaa sida roobka, Hadalkayguna wuxuu
u soo degayaa sida sayaxa, Sida roob yaru doogga ugu
da'o, iyo sida tiixu biqilka ugu tiixo, **3** Waayo, anigu waxaan
naadinayaa magicii Rabbiga. Idinku weyneeya Ilaaheenna.
**4** Isagu waa dhagaxa, shuqulkiisuna waa kaamil, Waayo,
jidadkiisa oo dhammu waa caddaalad, Isagu waa Ilaah
aamin ah, oo aan xumaan lahayn, Isagu waa xaq, waana
caaddil. **5** Way iskharribeen, oo carruurtiisii iyagu ma aha,
waa ceebtooda, Iyagu waa qarni qalloocan oo maroorsan.
**6** Dadyahow nacaska ah oo aan xigmadda lahaynu Ma
saasaad Rabbiga ugu abaalguddaan? War isagu sow ma
aha Aabbihiinnii idin soo iibsaday? Isagaa idin uumay oo idin
xoogeeyey. **7** Bal xusuuso waagii hore, Oo soo garwaaqso
qarniyo badan sannadahood, Aabbahaa weyddii oo wuu
ku ogeysiin doonaa, Odayaashaadana weyddii oo way kuu
sheegi doonaan. **8** Markii Ilaaha ugu wada sarreeyaa uu
quruumaha dhaxalkooda siiyey, Oo uu kala soocay binu-
aadmiga, Intii tirada reer binu Israa'iil ahayd Ayuu dadka
soohdimaha u dhigay, **9** Waayo, Rabbiga qaybtiisu waa
dadkiisa, Reer Yacquubna waa saamigii dhaxalkiisa. **10**
Wuxuu isaga ka dhex helay dhul lamadegaan ah, Iyo cidlada
baabba'a ah oo ay dugaaggu ka dhex ciyaan. Hareerihiisuu
isku wareejiyey, wuuna xannaaneeyey, Oo wuxuu isaga u
dhawray sida ishiisa inankeeda, **11** Sida gorgorku buulkiisii u
lulo, Oo dhashiisa ugu kor ruxmo, Oo baalashiisa u kala
bixiyo, oo uu u qaado, Oo garbihiisa ugu xambaaro, **12** Ayaa
Rabbiga oo keliya isaga hoggaamiyey, Oo ilaah qalaadna
lama joogin. **13** Wuuna fuuliyey meelaha sarsare ee dhulka,
Oo wuxuu cunay wixii beerta ka baxay, Wuxuuna ka dhigay
inuu nuugo malab dhagaxii ka soo baxay, Iyo saliid dhagax
madow ka soo baxday. **14** Wuxuuna quutay subag lo'aad,
iyo caano idaad, Iyo baraarro baruurtood, Iyo wananka
Baashaan, iyo riyaha, Iyo sarreenka ugu wanaagsan. Oo
dhiiggii canabkana waxaad ka cabtay khamri. **15** Laakiinse
Yeshuruun wuu cayilay, oo wax buu harraatiyey. Adigu
waad cayishay, waanad buurnaatay, oo xaydhaysatay.
Markaasuu ka tegey Ilaahii uumay, Oo quudhsaday Dhagaxii
badbaadadiisa. **16** Waxay isaga kaga hinaasiyeen ilaahyo
qalaad, Oo waxay kaga xanaajiyeen waxyaalo karaahiyo ah.
**17** Waxay wax u sadaqeeyeen jinniyo aan Ilaah ahayn, Iyo
ilaahyo ayan iyagu aqoon Oo ah kuwo cusub oo dhowaan
soo baxay, Oo awowayaashiin ayan ka cabsan jirin. **18**
Adigu Dhagaxii ku dhalay ma aad xusuusnid, Oo waad iska
illowday Ilaahii ku dhalay. **19** Rabbiguna wuu arkay, oo wuu
nacay, Maxaa yeelay, wiilashiisii iyo gabdhihiisii ayaa isaga
ka xanaajiyey. **20** Oo wuxuu yidhi, Wejigayga waan ka qarin
doonaa, Oo waxaan arki doonaa bal wixii ugu dambaystoodu
noqon doonto. Waayo, iyagu waa qarni aad u qalloocan
Iyo carruur aan iimaan lahayn. **21** Wax aan Ilaah ahayn
bay igaga hinaasiyeen, Oo waxay igaga cadhaysiiyeen
waxyaalahoodii aan waxtarka lahayn, Oo anna waxaan iyaga
kaga hinaasin doonaa kuwo aan dad ahayn, Oo waxaan kaga
cadhaysiin doonaa quruun nacas ah. **22** Waayo, dab baa ka
qaxmay cadhadaydii, Oo wuxuu gubaa ilaa meesha ugu
hoosaysa ee She'ool, Dhulkana wuu baabbi'iyaa iyo waxa ka
baxaba. Oo wuxuu dab ku dhejiyaa aasaaska buuraha. **(Sheol
h7585)** **23** Waxaan korkooda ku tuuli doonaa belaayooyin,
Oo fallaadhahaygana iyagaan ku gani doonaa. **24** Waxay
ku baabbi'i doonaan gaajo, oo waxay ku guban doonaan
kulayl qaxmaya Iyo halligaad qadhaadh, Oo waxaan ku
diri doonaa ilkaha dugaagga, Iyo waabayda waxyaalaha
ciidda ku gurguurta. **25** Dibadda waxaa ku layn doona seef,
guryaha gudahoodana cabsi, Oo barbaar iyo bikrad iyo
naasnuug iyo oday cirro lehba way wada baabbi'i doonaan.
**26** Waxaan idhi, Iyaga meel fog baan ku kala firdhin lahaa,
Oo xusuustoodana dadka dhexdiisa waan ka joojin lahaa,
**27** Haddaanan ka cabsanin cadowga cadhadiisa, Waaba
intaasoo ay cadaawayaashoodu si xun u macaamiloodaan,
Oo ay yidhaahdaan, Gacantayadii waa sarraysaa, Oo
waxyaalahan oo dhan Rabbigu ma uu samayn. **28** Waayo,
iyagu waa quruun aan talo lahayn, Oo innaba waxgarasho
kuma jirto. **29** Bal may caqli yeeshaan, oo ay waxan gartaan,
Oo bal may ka fikiraan ugu dambaystooda! **30** Haddaan
Dhagaxoodii iyaga iibin, Oo aan Rabbigu iyaga gacanta u

gelin, Sidee baa nin keliya kun u eryi karaa? Labase sidee
bay toban kun u didin karaan? 31 Dhagaxoodu ma aha sida
Dhagaxayaga. Oo xataa cadaawayaashayada qudhoodu
waxaas way kala gartaan. 32 Waayo, geedcanabkoodu
wuxuu ka yimid geedcanabkii Sodom, Iyo kii ku yiil beerihii
Gomora. Canabkoodu waa midho sumeed, Rucubyadooduna
waa qadhaadh. 33 Khamrigoodu waa jebiso waabaydeed,
Iyo mariidka xun ee jilbiska. 34 Tanu sow ilama kaydsana,
Iyadoo shaabadaysan oo khasnadahayga ku dhex jirta? 35
Aarsasho iyo abaalmarinba anigaa iska leh, Markay cagtoodu
simbiriirixan doonto, Waayo, maalintii masiibadoodu waa
dhow dahay, Oo waxyaalaha iyaga ku soo kor degi doona
ayaa deddejin doona. 36 Maxaa yeelay, Rabbigu dadkiisa
wuu xukumi doonaa, Oo addoommadiisana wuu ka nixi
doonaa, Markuu arko in xooggoodii dhammaaday, Oo aan
midna ku hadhin, mid xidhan iyo mid furan toona. 37 Oo
wuxuu odhan doonaa, Bal meeye ilaahyadoodii, Iyo dhagaxii
ay isku halleeyeen, 38 Oo cunay baruurtii allabaryadooda, Oo
cabbay khamrigii qurbaankoodii cabniinka ahaa? Haddaba
ha soo kaceen, oo ha idin caawiyeen, Oo iyagu ha idin
daafaceen. 39 Haddaba bal eega inaan aniga qudhuhu
ahay isagii, Oo aniga mooyaane aan ilaah kale jirin. Wax
baan dilaa, waanan soo nooleeyaa. Wax baan dhaawacaa,
waanan bogsiiyaa. Mana jiro mid gacantayda wax ka
samatabbixin karaa. 40 Waayo, gacantayda ayaan xagga
samada kor ugu qaadaa, Oo waxaan leeyahay, Weligay
waan noolahay. 41 Haddaan listo seeftayda dhalaalaysa, Oo
gacantayduna xukun qabsato, Cadaawayaashayda waan
ka aarsan doonaa, Oo kuwa i necebna waan u abaalgudi
doonaa. 42 Fallaadhahayga waan ku sakhraamin doonaa
Kuwa la dilay iyo maxaabiista dhiiggooda, Oo seeftayduna
waxay hilib ka cuni doontaa Madaxa hoggaamiyayaasha
cadowga. 43 Quruumahow, dadkiisa la reyreeya, Waayo,
isagu wuu aaran doonaa dhiiggii addoommadiisa, Oo
cadaawayaashiisana wuu ka aarsan doonaa, Oo dalkiisa iyo
dadkiisana buu u kafaaro gudi doonaa. 44 Markaasaa Muuse
yimid oo gabaygan erayadiisii oo dhan kula hadlay dhegihii
dadka, isaga iyo Yashuuca ina Nuunba. 45 Markaasaa Muuse
dhammeeyey hadalkii uu erayadan oo dhan kula hadlayay
reer binu Israa'iil oo dhan, 46 oo wuxuu ku yidhi, Qalbigiinna
ku qabsada kulli erayadan aan maanta idiin sheegay oo
dhan, kuwaasoo aad carruurtiinna ku amri doontaan si ay u
dhawraan oo u wada yeelaan sharcigan erayadiisa oo dhan.
47 Waayo, taasu idiinma aha wax aan waxtar lahayn, maxaa
yeelay, waaba naftiinnii, oo waxyaalahaas daraaddood ayaa
cimrigiinnu ugu dheeraan doonaa dalka aad Webi Urdun uga
gudbaysaan inaad hantidaan. 48 Oo Rabbigu isla maalintaas
qudheeda wuu la hadlay Muuse oo wuxuu ku yidhi, 49
Waxaad fuushaa buurtan Cabaariim, oo ah Buur Nebo oo ku
dhex taal dalka reer Moo'aab, oo ka soo hor jeeda Yerixoo,
oo bal waxaad fiirisaa dalka reer Kancaan oo aan reer
binu Israa'iil hantida u siinayo, 50 oo kolkaas ku dhimo
buurta aad fuulaysid, oo dadkaagii la urur, sidii walaalkaa
Haaruunba ugu dhintay Buur Xor, oo uu dadkiisii ula ururay,
51 maxaa yeelay, waad igu xadgudubteen idinkoo reer binu
Israa'iil dhex jooga markaad joogteen biyihii Meriibaah oo ku
taal Qaadeesh, oo cidladii Sin ku dhex taal, waayo, reer
binu Israa'iil dhexdooda quduus igagama aydaan dhigin. 52
Haddaba dalka hortaadaad ka arki doontaa, laakiinse geli
maysid dalka aan reer binu Israa'iil siinayo.

33 Tanu waa Muuse oo ahaa ninkii Ilaah ducadiisii uu
reer binu Israa'iil ugu duceeyey intuusan dhiman.
2 Isagoo leh, Rabbigu wuxuu ka yimid Siinay, Oo Seciir
ayuu uga soo kacay iyaga, Wuxuu ka soo iftiimay Buur
Faaraan, Oo ka yimid tobanka kun oo quduuska ah, Oo
gacantiisa midigtana waxaa iyaga ugu jiray sharci dab
ah. 3 Haah, isagu dadyowga wuu jecel yahay. Kuwiisa
quduuska ah oo dhammuna gacantaaday ku jiraan, Oo iyagu
waxay fadhiisteen cagahaaga, Oo waxay qaadanayaan
erayadaada. 4 Muuse wuxuu inagu amray sharci, Dhaxal
u ah shirka reer Yacquub. 5 Oo waxaa Yeshuruun ku
jiray boqor. Markii madaxda dadka qabiilooyinka reer binu
Israa'iil oo dhammu Ay soo wada urureen. 6 Ruubeen ha
noolaado oo yuusan dhiman, Oo raggiisu yuusan yaraan. 7
Tanuna waa ducadii uu Yahuudah ugu duceeyey, isagoo leh,
Rabbiyow, codka Yahuudah maqal, Oo isaga dadkiisa soo
dhex geli, Gacmihiisu ha ku filnaadeen, Oo adiguna ka caawi
cadaawayaashiisa. 8 Oo markuu Laawi u ducaynayayna
wuxuu yidhi, Tummiimkaagii iyo Uuriimkaagii waxay la jiraan
kaaga aad jeceshahay, Oo aad Masaah ku tijaabisay, Oo
aad biyihii Meriibaah agtooda kula dirirtay, 9 Kii aabbihiis
iyo hooyadiis yidhi, Anigu ma arag, Oo walaalihiisna aan
aqoonsan, Oo carruurtiisiina aan aqoon, Waayo, iyagu
erayadaadii way xajiyeen, Oo axdigaagiina way dhawreen.
10 Waxay reer Yacquub bari doonaan xukummadaada, Reer
binu Israa'iilna sharcigaaga. Hortaada waxay soo dhigi
doonaan foox, Oo meeshaada allabarigana waxay saari
doonaan allabari dhan oo la gubo. 11 Haddaba Rabbiyow
xoolihiisa barakee, Oo shuqulka gacmihiisana aqbal, Oo
kuwii isaga ku kaca iyo kuwa necebna Dhexda ku dhufo
si ayan mar dambe u kicin. 12 Oo markuu Benyaamiin u
ducaynayayna wuxuu yidhi, Kan Rabbigu jecel yahay wuxuu
ammaan u fadhiyi doonaa meel cagtiisa ah, Oo maalintii oo

dhanna gaashaan buu u yahay, Oo wuxuu deggan yahay
garbihiisa dhexdooda. 13 Oo markuu Yuusuf u ducaynayayna
wuxuu yidhi, Dalkiisu ha ahaado mid Rabbigu ku barakeeyo
Waxyaalaha qaaliga ah oo samada, iyo sayaxa, Iyo moolka
hoos fidsan, 14 Iyo waxyaalaha qaaliga ah oo ah midhaha
qorraxda, Iyo waxyaalaha qaaliga ah oo ah waxyaalaha bilaha
soo baxa, 15 Iyo waxyaalaha ugu wanaagsan ee buuraha
gaboobay, Iyo waxyaalaha qaaliga ah oo kuraha daa'imiska
ah, 16 Iyo dhulka waxyaalihiisa qaaliga ah iyo buuxnaantiisa,
Iyo kii duurka degganaa raallinimadiisa. Barakadaasu ha ku
soo degto madaxa Yuusuf, Isagoo ahaa kii walaalihiis laga
soocay. 17 Sida dibigiisa curadka ah weynaan buu leeyahay,
Oo geesihiisuna waa sidii geeso gisi, Oo wuxuu ku hardiyi
doonaa dadka dunida dhinacyadeeda jooga oo dhan, Oo
iyagu waa tobanka kun oo reer Efrayim, Iyo kumaanyaalka
reer Manaseh. 18 Oo markuu Sebulun u ducaynayayna
wuxuu yidhi, Sebulunow, ku farax baxniintaada, Adiguna
Isaakaarow, ku farax teendhooyinkaaga. 19 Iyagu waxay
dadka ugu yeedhi doonaan buurta, Oo halkaasay ku bixin
doonaan allabaryada xaqnimada, Waayo, waxay nuugi
doonaan hodantinimada badaha Iyo bacaadka qasnadihiisa
qarsoon. 20 Oo markuu Gaad u ducaynayayna wuxuu yidhi,
Barako ha ku dhacdo kii reer Gaad ballaadhiya, Isagu wuxuu
u jiifaa sida gool libaax, Oo wuxuu dillaacsadaa gacanta
iyo madaxa dhaladiisa. 21 Isagaa doortay qaybtii kowaad,
Waayo, halkaas qaybtii taliyaha baa lagu kaydiyey, Wuxuu
soo raacay madaxdii dadka, Oo wuxuu reer binu Israa'iil la
sameeyey caddaaladdii Rabbiga iyo xukummadiisiiba. 22 Oo
markuu Daan u ducaynayayna wuxuu yidhi, Daan waa dhal
libaax, Oo ka soo booda Baashaan. 23 Oo markuu Naftaali u
ducaynayayna wuxuu yidhi, Naftaaliyow, kaaga raallinimo ka
dhergayow, Oo barakadii Rabbiga ka buuxsantayow, Adigu
hanti galbeedka iyo koonfurta. 24 Oo markuu Aasheer u
ducaynayayna wuxuu yidhi, Aasheer ku wiilasha ku dhex
barakaysan ha ahaado, Oo hana ahaado kan walaalihiis u
bogaan, Oo cagtiisana saliid ha daro. 25 Kabahaagu waxay
ahaan doonaan bir iyo naxaas, Oo intay maalmahaagu yihiin
xooggaaguna ha ahaado. 26 Yeshuruunow, wax Ilaah la
mid ah ma jiro, Kaasoo samada u fuula, inuu ku caawiyo,
Cirkana sharaftiisa u fuula. 27 Ilaaha daa'imka ahu waa
hoygaaga, Oo waxaa kaa hooseeya gacmo weligood jira.
Oo cadowgana hortaaduu ka tuuray, Oo yidhi, Baabbi'i. 28
Oo Israa'iil oo ah isha Yacquub oo keliya Ammaan buu
ku deggan yahay dal sarreen iyo khamri leh, Oo waxaa
samada uga soo da'a sayax. 29 Reer binu Israa'iilow, waad
faraxsan tihiin. Bal yaa idinla mid ah, oo ah dad uu Rabbigu
badbaadiyey, Kaasoo ah gaashaanka caawimaaddiinna,
Iyo seefta sharaftiinna. Cadaawayaashiinnu way isu kiin
dhiibi doonaan, Oo waxaad cag marin doontaan meelahooda
sarsare.

34 Markaasaa Muuse bannaankii Moo'aab ka tegey oo
wuxuu aaday Buur Nebo, oo fuulay dhaladii Buur
Fisgaah oo Yerixoo ka soo hor jeedda. Kolkaasaa Rabbigu
isagii tusay dalkii Gilecaad oo dhan iyo tan iyo Daan, 2
iyo dalkii reer Naftaali oo dhan, iyo dalkii reer Efrayim iyo
reer Manaseh, iyo dalkii reer Yahuudah oo dhan, tan iyo
badda galbeed, 3 iyo xagga koonfureed, iyo bannaanka
dooxada Yerixoo oo ah magaalada geedaha timireed, iyo
tan iyo Socar. 4 Oo Rabbigu wuxuu isagii ku yidhi, Waa
kaas dalkii aan ugu dhaartay Ibraahim iyo Isxaaq iyo
Yacquub oo aan midkood kasta ku idhi, Dalkaas waxaan
siinayaa farcankaaga. Haddaba waxaan ka dhigay inaad
indhahaaga ku aragto, laakiinse xaggaas u gudbi maysid.
5 Sidaas daraaddeed Muuse oo ahaa addoonkii Rabbigu
meeshaasoo ahayd dalkii reer Moo'aab ayuu ku dhintay,
sida erayga Rabbigu ahaa. 6 Oo wuxuu isagii ku aasay
dooxada ku taal dalka Moo'aab oo ka soo hor jeeda
Beytfecoor, laakiinse ilaa maantadan la joogo ma jiro nin
qabrigiisii yaqaan. 7 Oo Muuse markuu dhintay wuxuu jiray
boqol iyo labaatan sannadood, oo haddana indhihiisu ma
aragdarnaan, xooggiisiina kama yaraan. 8 Oo reer binu
Israa'iilna soddon maalmood ayay Muuse ugu ooyayeen
bannaankii Moo'aab, haddaba maalmihii loo barooranayay
Muuse way dhammaadeen. 9 Oo Yashuuca ina Nuunna
waxaa ka buuxay ruuxa xigmadda, maxaa yeelay, Muusaa
gacmihiisa mar hore saaray, oo reer binu Israa'iil isagii way
maqleen, oo sidii Rabbigu Muuse ku amray ayay sameeyeen.
10 Oo tan iyo waagaasna reer binu Israa'iil kama dhex kicin
nebi Muuse la mid ah oo Rabbigu fool ka fool u yaqaan.
11 Oo ma jirin mid sameeyey calaamooyinkii iyo yaababkii
uu Rabbigu isaga dalkii Masar ugu diray inuu ku sameeyo
Fircoon, iyo addoommadiisii oo dhan, iyo dalkiisii oo dhan,
12 waxyaalahaasoo uu Muuse gacantii xoogga badnayd oo
dhan iyo cabsidii weynayd oo dhan kaga sameeyey reer
binu Israa'iil oo dhan hortooda.

# Yashuuca

**1** Addoonkii Rabbiga oo Muuse ahaa markuu dhintay
dabadeed, Rabbigu wuxuu la hadlay Yashuuca ina Nuun,
oo Muuse midiidin u ahaa, oo wuxuu ku yidhi, **2** Addoonkaygii
Muuse ahaa waa dhintay, haddaba kac, oo webigan Urdun
ka tallaaba, adiga iyo dadkan oo dhammuba, oo waxaad
u gudubtaan dalka aan siinayo iyaga, kuwaasoo ah reer
binu Israa'iil. **3** Meel kasta oo aad cagta dhigtaanba waan
idin siiyey, sidaan Muuse ugu sheegay. **4** Oo soohdintiinnu
waxay noqon doontaa marka laga bilaabo cidlada, iyo
Lubnaantan, iyo xataa tan iyo webiga weyn oo ah Webi
Yufraad, iyo dalka reer Xeed oo dhan, iyo tan iyo badda
weyn ee xagga qorraxdu u dhacdo. **5** Cimrigaaga oo dhan
ninna isma kaa hor taagi kari doono. Sidaan Muuse ula jiray
ayaan adigana kuula jiri doonaa. Kuma aan gabi doono,
kumana aan dayrin doono. **6** Haddaba xoog yeelo, oo aad
u dhiirranow, waayo, dadkan waxaad dhaxalsiisaa dalkii
aan ugu dhaartay awowayaashood inaan iyaga siiyo. **7**
Xoog uun yeelo, oo aad u dhiirranow inaad dhawrtid oo
aad yeeshid si waafaqsan sharcigii addoonkaygii Muuse
kugu amray oo dhan. Si aad ugu liibaantid meel kastoo aad
tagtidba, sharcigaas ha uga leexan midigta iyo bidixda toona.
**8** Kitaabkan sharcigu waa inaanu afkaaga ka tegin, laakiinse
waa inaad u fiirsataa habeen iyo maalinba, si aad u dhawrtid
wax alla waxa ku qoran oo dhan, waayo, markaasaad
jidkaaga ku barwaaqoobi doontaa, waanad liibaani doontaa.
**9** Miyaanan kugu amrin? Xoog yeelo, oo aad u dhiirranow.
Ha cabsan, hana qalbi jabin, waayo, Rabbiga Ilaahaaga
ahu wuu kula jiraa meel kastoo aad tagtidba. **10** Markaasaa
Yashuuca wuxuu amray saraakiishii dadka, oo ku yidhi, **11**
Bal xerada dhex mara, oo waxaad dadka ku amartaan, oo
ku tidhaahdaan, Saadkiinna diyaarsada, waayo, saddex
maalmood waa inaad kaga gudubtaan webigan Urdun inaad
gashaan oo hantidaan dalkii Rabbiga Ilaahiinna ahu hanti
ahaan idiin siinayo. **12** Oo Yashuuca wuxuu la hadlay reer
Ruubeen, iyo reer Gaad, iyo qabiilka reer Manaseh badhkiis,
oo wuxuu ku yidhi, **13** Bal xusuusta eraygii addoonkii
Rabbiga oo Muuse ahaa idinku amray isagoo leh, Rabbiga
Ilaahiinna ahu waa idin nasinayaa, oo wuxuu idin siin doonaa
dalkan. **14** Dumarkiinna, iyo dhallaankiinna, iyo xoolihiinnuba
waxay joogi doonaan dalkii Muuse idinka siiyey Webi Urdun
shishadiisa, laakiinse raggiinna xoogga leh oo hubka sita
oo dhammu waa inay walaalahood ka hor gudbaan, oo ay
caawiyaan iyaga, **15** ilaa Rabbigu walaalihiin nasiyo, siduu
idinkaba idiin nasiyey, oo ay iyana hantiyaan dalkii Rabbiga
Ilaahiinna ahu iyaga siinayo; oo markaasaad ku soo noqon
doontaan dalkii hantidiinna, oo waad hantiyi doontaan dalkii
addoonkii Rabbiga oo Muuse ahaa idinka siiyey Webi Urdun
shishadiisa oo ah xagga qorrax ka soo baxa. **16** Markaasay
Yashuuca ugu jawaabeen, Kulli wixii aad nagu amartay oo
dhan waannu yeeli doonnaa, oo meel alla meeshii aad noo
dirtoba waannu tegi doonnaa. **17** Oo sidii aannu Muuse
wax walba uga dhegaysan jirnay ayaannu adigana kaaga
dhegaysan doonnaa. Rabbiga Ilaahaaga ahu uun ha kula jiro
siduu Muuse ula jiray oo kale. **18** Oo ku alla kii amarkaaga
caasiya oo aan dhegaysan erayadaada iyo wax alla wixii
aad ku amartid oo dhanba, kaas waa in la dilaa; laakiinse
xoog yeelo oo aad u dhiirranow.

**2** Markaasaa Yashuuca ina Nuun wuxuu Shitiim si qarsoon
uga diray laba nin oo basaasyo ah, oo wuxuu ku yidhi,
Bal taga oo soo ilaaleeya dalka iyo magaalada Yerixoo.
Markaasay tageen, oo waxay galeen guri naag dhillo ah oo
magaceeda la odhan jiray Raxab, oo halkaasay jiifsadeen. **2**
Oo markaasaa boqorkii Yerixoo loo sheegay oo lagu yidhi,
Niman reer binu Israa'iil ah ayaa caawa magaalada yimid si
ay dalka u ilaaleeyaan. **3** Markaasaa boqorkii Yerixoo cid u
diray Raxab, oo ku yidhi, Soo bixi nimankii kuu yimid oo
gurigaaga galay, waayo, waxay u yimaadeen si ay dalka oo
dhan u ilaaleeyaan. **4** Laakiin naagtii mar horay kaxaysay
labadii nin, wayna qarisay; oo waxay tidhi, Haah, nimankii
waa ii yimaadeen, laakiinse ma aan garanaynin meel ay
ka yimaadeen, **5** oo markii iridda la xidhi lahaa oo ay
gudcur noqotay ayay nimankii baxeen. Meeshii nimankii
tageenna anigu garan maayo; haddaba dhaqso u raacdeeya,
waayo, waad gaadhi karaysaan. **6** Laakiinse waxay iyagii
keentay saqafkii dushiisa, oo waxay ku qarisay caws linen la
yidhaahdo oo ay qummaati ugu dhigtay saqafka dushiisa. **7**
Nimankiina markaasay u raacdaysteen xagga Webi Urdun
ilaa meeshii laga gudbi jiray; oo isla markii kuwii iyaga
raacdaynayay baxeen ayaa iriddii la xidhay. **8** Oo intaanay
seexan ka hor ayaa naagtii saqafkii ugu timid iyagii, **9** oo
waxay nimankii ku tidhi, Anigu waan ogahay in Rabbigu
dalka idin siiyey, oo cabsidiinnii baa nagu dhacday, iyo in
kuwa dalka deggan oo dhammu ay hortiinna ku dhalaaleen.
**10** Waayo, waxaannu maqalnay sidii Rabbigu hortiinna uga
engejiyey biyihii Badda Cas, markii aad Masar ka soo
baxdeen, iyo wixii aad ku samayseen labadii boqor oo
Siixon iyo Coog oo ahaa reer Amor, ee joogay Webi Urdun
shishadiisa, oo aad wada baabbi'iseen. **11** Oo isla markii
aannu maqalnay ayaannu dhalaalnay, oo idinka daraaddiin
ninna xoog kuma hadhin; maxaa yeelay, Rabbiga Ilaahiinna
ahu waa Ilaaha samada sare iyo dhulka hooseba jooga. **12**

Haddaba sidaas daraaddeed waan idin baryayaaye, Rabbiga
iigu dhaarta inaad reerka aabbahay ugu roonaanaysaan
sidaan idiinku roonaaday oo kale, oo i siiya calaamo run
ah; 13 iyo inaad badbaadinaysaan aabbahay, iyo hooyaday,
iyo walaalahay, iyo waxay haystaan oo dhan, iyo inaad
naftayada dhimasho ka samatabbixinaysaan. 14 Markaasaa
nimankii waxay naagtii ku yidhaahdeen, Naftayadu waxay u
bixi doontaa tiinna, haddaydnan sheegin xaalkayaga, oo
markii Rabbigu dalka na siiyo roonaan iyo daacadnimo
ayaannu kugula macaamiloon doonnaa. 15 Kolkaasay xadhig
daaqadda kaga dhex dejisay, waayo, gurigeedu wuxuu ku
yiil magaalada derbigeeda, oo waxay degganayd derbiga
dushiisa. 16 Oo waxay iyagii ku tidhi, Buurta xaggeeda taga,
yaan raacdadu idin heline, oo intii saddex maalmood ah
halkaas ku dhuunta, ilaa ay raacdadu ka soo noqonayso;
dabadeedna jidkiinna iska mara. 17 Kolkaasaa nimankii
waxay iyadii ku yidhaahdeen, Bal ogow, annagu eed kuma
yeelan doonno dhaartaadan aad nagu dhaarisay. 18 Markii
aannu dalka nimaadno, xadhiggan dunta guduudan ah waa
inaad ku xidhaa daaqaddii aad naga dejisay. Oo waa inaad
guriga gudihiisa ku soo urursataa aabbahaa, iyo hooyadaa,
iyo walaalahaa, iyo reerka aabbahaa oo dhan. 19 Oo waxay
ahaan doontaa, in ku alla kii ka baxa albaabbada gurigaaga
oo jidka maraba, uu dhiiggiisu ahaan doono dushiisa, oo
annana aannan eed ku yeelanaynin, iyo in ku alla kii guriga
kugula jira haddii far la saaro, uu dhiiggiisu dushayada
ahaan doono. 20 Laakiinse haddaad xaalkayaga sheegto,
de markaas eed kuma yeelan doonno dhaartaadii aad nagu
dhaarisay. 21 Kolkaasay waxay ku tidhi, Sidaad tidhaahdeen
ha ahaato. Kolkaasay iska dirtay, oo iyana way ka tageen;
markaasay xadhiggii guduudnaa daaqaddii ku xidhay. 22
Kolkaasay tageen, oo waxay yimaadeen buurtii, oo halkaasay
saddex maalmood joogeen, ilaa ay raacdadii ka soo noqotay;
oo raacdadiina jidka oo dhan bay ka doondooneen, laakiinse
ma ay helin. 23 Markaasaa labadii nin noqdeen; buurtii bay
ka degeen, oo intay webigii gudbeen ayay u yimaadeen
Yashuuca ina Nuun; kolkaasay u sheegeen wixii ku dhacay
oo dhan. 24 Oo waxay Yashuuca ku yidhaahdeen, Sida runta
Rabbigu dalka oo dhan gacmaheennuu geliyey, oo weliba,
kuwa dalka deggan oo dhammu horteenay ku dhalaalayaan
kulligood.

3 Markaasaa Yashuuca wuxuu kacay aroor hore, oo Shitiim
way ka guureen, oo Webi Urdun yimaadeen, isagii iyo
reer binu Israa'iil oo dhan, oo halkaasay degeen intaanay
gudbin ka hor. 2 Oo saddex maalmood dabadeed saraakiishii
xeraday dhex mareen, 3 oo waxay dadkii ku amreen oo ku
yidhaahdeen, Markaad aragtaan sanduuqii axdiga Rabbiga
Ilaahiinna ah, iyo wadaaddada reer Laawi oo isaga sida
waa inaad meeshiinna ka guurtaan, oo daba gashaan isaga.
4 Oo weliba waa in meel bannaan oo qiyaasteedu dhan
tahay laba kun oo dhudhun idiin dhexaysaa idinka iyo
sanduuqa. Ha u soo dhowaanina isaga, si aad u ogaataan
jidkii aad mari lahaydeen; waayo, idinku hadda ka hor
ma aydaan marin jidkan. 5 Markaasaa Yashuuca wuxuu
dadkii ku yidhi, Quduus iska dhiga, waayo, berri Rabbigu
wuxuu dhexdiinna ku samayn doonaa waxyaalo yaab leh.
6 Oo Yashuuca wadaaddadii buu la hadlay, oo ku yidhi,
Sanduuqa axdiga qaada, oo dadka ka hor gudba. Kolkaasay
waxay qaadeen sanduuqii axdiga, oo dadkiina way ka hor
mareen. 7 Markaasaa Rabbigu Yashuuca ku yidhi, Maantaan
bilaabayaa inaan kugu weyneeyo reer binu Israa'iil hortooda,
inay ogaadaan in sidii aan Muuse ula jiray, aan adigana
kuula jiri doono. 8 Oo waa inaad amartaa wadaaddada
sanduuqa axdiga sida, oo waxaad ku tidhaahdaa, Markii
aad gaadhaan biyaha Webi Urdun qarkooda waa inaad
Webi Urdun isdhex taagtaan. 9 Markaasaa Yashuuca
wuxuu reer binu Israa'iil ku yidhi, Kaalaya halkan, oo maqla
erayada Rabbiga Ilaahiinna ah. 10 Oo Yashuuca wuxuu
yidhi, Sidan baad ku ogaan doontaan in Ilaaha nool idin
dhex joogo, iyo inuu shakila'aan hortiinna ka eryi doono reer
Kancaan, iyo reer Xeed, iyo reer Xiwi, iyo reer Feris, iyo
reer Girgaash, iyo reer Amor, iyo reer Yebuus. 11 Bal eega,
Rabbiga dhulka oo dhan sanduuqiisii axdiga ayaa idin hor
maraya xagga Webi Urdun dhexdiisa. 12 Haddaba sidaas
daraaddeed laba iyo toban nin ka soo bixiya qabiilooyinka
reer binu Israa'iil, qabiil walba nin. 13 Oo markii wadaaddada
sida sanduuqa Rabbiga ah Rabbiga dhulka oo dhan ay
calaacalaha cagahoodu taabtaan biyaha Webi Urdun, ayaa
biyaha Webi Urdun kala go'i doonaan, kuwaasoo ah biyaha
kor ka imanaya, oo markaasay meel istaagi doonaan iyagoo
tuulan. 14 Oo markii dadku ka tegey teendhooyinkooda
si ay Webi Urdun uga gudbaan aawadeed, iyadoo ay ka
horreeyaan wadaaddada sida sanduuqii axdiga, 15 oo markii
kuwa sanduuqa sida ay soo gaadheen Webi Urdun, oo
wadaaddada sida sanduuqa ay cagahoodu galeen biyaha
qarkooda, (waayo, xilliga waxgoosashada oo dhan Webi
Urdun qararkiisa oo dhan buu buuxdhaafaa) 16 ayay biyaha
kor ka imanayay istaageen, iyagoo tuulan, oo meel aad
u fog bay istaageen oo u dhow magaalada la yidhaahdo
Aadaam oo ku ag taal Saaretaan. Kuwii hoos u kacay xagga
badda Caraabaah, taasoo ah Badda Cusbada leh, iyana
kulligood waa go'een; oo dadkii wuxuu u gudbay meel ku
toosan Yerixoo. 17 Oo wadaaddadii siday sanduuqii axdiga

Rabbiga waxay istaageen dhul engegan oo Webi Urdun
dhexdiisa ah, oo reer binu Israa'iil oo dhammu waxay ku
gudbeen dhul engegan, ilaa ay quruuntii oo dhammu ka
wada gudubtay Webi Urdun.

4 Oo markii quruuntii oo dhammu ay ka wada gudubtay
Webi Urdun, ayaa Rabbigu Yashuuca la hadlay, oo ku
yidhi, 2 Dadka kala bax laba iyo toban nin, qabiil walba nin, 3
oo waxaad iyaga ku amartaa oo ku tidhaahdaa, Webi Urdun
dhexdiisa oo ah meeshii cagaha wadaaddadu istaageen,
waxaad ka qaaddaan laba iyo toban dhagax, oo waxaad ula
gudubtaan dhanka kale, oo waxaad dhigtaan meeshaad
caawa ku dhaxaysaan. 4 Markaasaa Yashuuca u yeedhay
laba iyo tobankii nin, oo uu ka diyaariyey reer binu Israa'iil,
oo qabiil walbana nin buu ka soo soocay. 5 Oo Yashuuca
wuxuu ku yidhi iyagii, Ka hor gudba sanduuqa Rabbiga
Ilaahiinna ah, oo waxaad tagtaan Webi Urdun dhexdiisa,
oo midkiin waluba dhagax garabka ha ku qaado, inta reer
binu Israa'iil qabiilooyinkooda tiradoodu tahay, 6 in taasu
idiin ahaato calaamo idin dhex taal, oo wakhtiga soo socda
markii carruurtiinnu idin weyddiiyaan, oo idinku yidhaahdaan,
Maxaad ula jeeddaan dhagaxyadan? 7 Waxaad ku odhan
doontaan, Sababtu waxa weeye, biyihii Webi Urdun baa
ku hor kala go'ay sanduuqa axdiga Ilaah; oo markii uu ka
gudbayay Webi Urdun ayay biyihii Webi Urdun kala go'een;
oo dhagaxyadanu xusuus bay u ahaan doonaan reer binu
Israa'iil weligood. 8 Oo reer binu Israa'iil waxay yeeleen sidii
Yashuuca ku amray, oo waxay Webi Urdun dhexdiisa ka
qaadeen laba iyo toban dhagax, oo ah intii qabiilooyinka
reer binu Israa'iil tiradoodu ahayd sidii Rabbigu u sheegay
Yashuuca, oo waxay u gudbiyeen meeshii ay ku dhaxeen,
oo halkaasay dhigeen. 9 Oo Yashuuca wuxuu laba iyo
toban dhagax qotomiyey Webi Urdun dhexdiisa, taasoo ah
meeshii wadaaddada sida sanduuqa axdiga ay cagahoodu
istaageen; oo ilaa maantadan weli meeshii bay jiraan. 10
Waayo, wadaaddadii siday sanduuqa waxay istaageen Webi
Urdun dhexdiisa, ilaa ay dhammaadeen wax waluba wixii
Rabbigu ku amray Yashuuca inuu dadka kula hadlo, sidii
wixii Muuse ku amray Yashuuca oo dhan, oo dadkiina way
degdegeen oo gudbeen. 11 Oo waxaa dhacday markii ay
dadkii oo dhammu wada gudbeen inuu sanduuqii Rabbiguna
gudbay, isaga iyo wadaaddadiiba, dadkii oo arka. 12 Oo reer
Ruubeen, iyo reer Gaad, iyo qabiilkii reer Manaseh badhkiis
ayaa reer binu Israa'iil ka hor gudbay, iyagoo hub leh, sidii
Muuse kula hadlay iyaga. 13 Qiyaas afar kun oo nin oo
hub leh oo dagaal diyaar u ah ayaa Rabbiga hortiisa ka
gudubtay oo dagaal ugu kacday xagga bannaanka Yerixoo.
14 Oo maalintaas Rabbigu wuxuu Yashuuca ku weyneeyey
reer binu Israa'iil oo dhan hortooda; oo cimrigiisii oo dhanba
way ka cabsadeen isagii, sidii ay Muuse uga baqi jireen
oo kale. 15 Markaasaa Rabbigu Yashuuca la hadlay, oo ku
yidhi, 16 Wadaaddada sanduuqa maragga sida waxaad ku
amartaa inay ka soo baxaan Webi Urdun. 17 Oo sidaas
daraaddeed Yashuuca baa amray wadaaddadii, oo ku yidhi,
Ka soo baxa Webi Urdun. 18 Oo markii wadaaddadii siday
sanduuqa axdigii Rabbiga ay ka soo dhex bexeen Webi
Urdun, oo ay cagaha u qaadeen dhul engegan, ayay biyihii
Webi Urdun meeshoodii ku soo noqdeen, oo ay qararkiisii oo
dhan ka daateen sidii markii hore. 19 Oo dadku waxay Webi
Urdun ka soo bexeen maalintii tobnaad oo bishii kowaad, oo
waxay degeen Gilgaal oo xagga bari ka xigta Yerixoo. 20 Oo
laba iyo tobankii dhagax oo ay ka soo qaadeen Webi Urdun
dhexdiisa ayuu Yashuuca qotomiyey Gilgaal. 21 Markaasuu
ka hadlay reer binu Israa'iil, oo wuxuu ku yidhi, Wakhtiga
soo socda markii carruurtiinnu aabbayaashood weyddiiyaan,
oo yidhaahdaan, Maxaad ula jeeddaan dhagaxyadan? 22
Waxaad carruurtiinna ogeysiisaan, oo ku tidhaahdaan, Reer
binu Israa'iil Webigan Urdun waxay kaga soo gudbeen dhul
engegan. 23 Waayo, Rabbiga Ilaahiinna ah baa hortiinna ka
engejiyey biyihii Webi Urdun, ilaa aad ka soo gudubteen,
sidii Rabbiga Ilaahiinna ahu u galay Badda Cas oo kale,
tii uu hortayada ka engejiyey ilaa aannu ka gudubnay,
24 si ay dadka dhulka jooga oo dhammu u ogaadaan
gacanta Rabbigu inay xoog badan tahay; oo ay weligood
uga cabsadaan Rabbiga Ilaahiinna ah.

5 Oo boqorradii reer Amor oo dhan oo joogay Webi Urdun
xaggiisa shishe oo galbeed, iyo boqorradii reer Kancaan
oo dhan oo badda dhinaceeda degganaa, markay maqleen
sida Rabbigu biyihii Webi Urdun u engejiyey reer binu
Israa'iil hortooda ilaa aannu soo wada gudubnay, ayay wada
dhalaaleen, oo xoog dambena kuma jirin, reer binu Israa'iil
aawadood. 2 Oo markaasuu Rabbigu wuxuu Yashuuca ku
yidhi, Waxaad samaysaa mindiyo dhagax adag ah, oo reer
binu Israa'iil haddana ku gud mar labaad. 3 Markaasaa
Yashuuca wuxuu samaystay mindiyo dhagax adag ah, oo
wuxuu reer binu Israa'iil ku guday meel la yidhi Buurta
Buuryada. 4 Oo Yashuuca sababtii uu u gudayna waxay
ahayd sidan: dadkii dalkii Masar ka soo baxay oo dhammu,
intii labka ahayd, xataa raggii dagaalyahannada ahaa oo
dhammuba waxay ku dhinteen cidlada intay jidka ku jireen
markay Masar ka soo bexeen dabadeed. 5 Oo dadkii soo
baxay oo dhammu way gudnaayeen; laakiinse kulli dadkii
cidlada ku dhashay intay jidka ku jireen markay Masar
ka soo bexeen dabadeed, kuwaas lama gudin. 6 Waayo,

reer binu Israa'iil waxay cidlada dhex socdeen afartan
sannadood, ilaa quruuntii oo dhan ay ka dhammaadeen
xataa raggii dagaalyahannada ahaa oo Masar ka soo baxay
oo dhammu, waayo, waxay maqli waayeen codkii Rabbiga;
kuwaas oo Rabbigu ugu dhaartay inaanu u oggolaanayn
inay arkaan dalkii Rabbigu ugu dhaartay awowayaashood
inuu annagana siin doono, dalkaas oo ah dal caano iyo
malab la barwaaqaysan. 7 Oo carruurtoodii oo uu Rabbigu
meeshoodii ka kiciyey, ayaa Yashuuca guday; maxaa yeelay,
waxay ahaayeen buuryoqab, waayo, jidka laguma soo
gudin. 8 Oo markay quruuntii oo dhan wada gudeen, waxay
iska joogeen meelahoodii ahaa xerada dhexdeeda ilaa ay
ka bogsadeen. 9 Oo Rabbigu wuxuu Yashuuca ku yidhi,
Maantaan idinka rogay ceebtii Masar, oo sidaas daraaddeed
meeshaas ilaa maantadan la joogo waxaa lagu magacaabaa
Gilgaal. 10 Oo reer binu Israa'iil waxay degeen Gilgaal; oo
bisha maalinteedii afar iyo tobnaad markay fiidkii ahayd ayay
bannaankii Yerixoo ku sameeyeen Iiddii Kormaridda. 11 Oo
maalintii Iidda Kormaridda ka dambaysay waxay cuneen
hadhuudhkii dalkii ka baxay, kaas oo ahaa kibis aan khamiir
lahayn, iyo hadhuudh la dubay, maalintaas qudheeda. 12 Oo
maannadiina maalintii dambe ayay ka joogsatay, markay
cuneen hadhuudhkii dalkii ka baxay dabadeed, oo reer binu
Israa'iilna ma ay helin maanna dambe, laakiinse sannaddaas
waxay cuneen midhihii dalkii Kancaan ka baxay. 13 Oo
markii Yashuuca joogay Yerixoo agteeda ayuu indhihiisa kor
u taagay oo wax fiiriyey, oo wuxuu arkay nin isaga ka soo hor
jeeda oo seeftiisii oo gal la' gacanta ku haysta. Markaasaa
Yashuuca intuu u tegey ku yidhi, War ma annagaad nala
gees tahay mise colkayagaad la gees tahay? 14 Markaasuu
isna wuxuu ku yidhi, Maya; laakiinse waxaan haatan u imid
inaan madax u ahaado ciidanka Ilaah. Markaasaa Yashuuca
wejigiisii dhulka saaray, wuuna sujuuday, oo wuxuu isagii ku
yidhi, Sayidkaygiiyow, maxaad anoo addoonkaaga ah igu
odhan lahayd? 15 Markaasaa kii ciidanka Rabbiga madax u
ahaa wuxuu Yashuuca ku yidhi, Kabtaada iska siib, waayo,
meeshaad ku taagan tahay waa quduus. Oo Yashuucana
sidaasuu yeelay.

6 (Haddaba Yerixoo waxaa loo xidhay reer binu Israa'iil
aawadood; oo lamana geli jirin, lagamana bixi jirin.) 2
Markaasaa Rabbigu wuxuu Yashuuca ku yidhi, Bal eeg,
adigaan gacanta kuu geliyey Yerixoo, iyo boqorkeeda, iyo
ragga xoogga leh. 3 Oo waa inaad magaalada hareeraysaan,
oo raggiinna dagaalyahannada ah oo dhammu magaalada
mar ku soo wareega. Oo sidaas waxaad yeeshaan lix
maalmood. 4 Oo toddoba wadaad waa inay sanduuqa
hortiisa socdaan iyagoo wata toddoba buun oo wanan
geesahood ah, oo maalinta toddobaad waa inaad magaalada
ku soo wareegtaan toddoba jeer, oo wadaaddaduna waa inay
buunanka afuufaan. 5 Oo markay aad u afuufaan buunanka
wananka geesahooda ah, oo idinku aad maqashaan
dhawaaqa buunka, dadka oo dhammu qaylo dheer waa inay
ku qayliyaan, oo markaasaa derbiga magaaladu meeshiisa
ku dhici doonaa, dadkuna waa inuu nin waluba hortiisa
qummaati ugu socdaa. 6 Markaasaa Yashuuca ina Nuun
wadaaddadii u yeedhay, oo ku yidhi, Sanduuqa axdiga kor u
qaada, oo sanduuqa Rabbiga toddoba wadaad ha la hor
socdeen toddoba buun oo wanan geesahood ah. 7 Oo waxay
dadkii ku yidhaahdeen, Socda oo magaalada hareereeya, oo
ragga hubka sitaana ha ka hor mareen sanduuqa Rabbiga.
8 Oo sidii bay noqotay. Markii Yashuuca la hadlay dadkii
waxaa socday oo Rabbiga hortiisa maray toddobadii wadaad
oo sidda toddobadii buun oo wanan geesahood ah; oo
waxay afuufeen buunankii; oo sanduuqii axdiga Rabbiguna
waa lala daba socday. 9 Oo raggii hubka sitayna waxay hor
socdeen wadaaddadii buunanka afuufayay, oo ururkii intiisii
kalena waxay daba socdeen sanduuqa, oo wadaaddaduna
buunankay afuufayeen intay socdeen. 10 Oo Yashuuca
wuxuu dadkii ku amray oo ku yidhi, Waa inaydnaan qaylin,
codkiinnana waa inaan la maqlin, afkiinnana eray qudh ah
yaanu ka soo bixin, ilaa maalintii aan idinku amro inaad
qaylisaan; oo markaas waa inaad qaylisaan. 11 Oo sidaasuu
sanduuqii Rabbiga ugu soo wareejiyey magaaladii, oo mar
bay ku soo wareegeen hareeraheeda; oo markaasay ku
noqdeen xeradii, waxayna u hoydeen xeradii. 12 Markaasaa
Yashuuca wuxuu kacay aroor hore, oo wadaaddadiina waxay
kor u qaadeen sanduuqii Rabbiga. 13 Toddobadii wadaad
oo sidday toddobadii buun oo wanan geesahood ahna,
waxay had iyo goorba hor socdeen sanduuqii Rabbiga, oo
waxay afuufeen buunankii; oo raggii hubka sitayna iyagay
ka horreeyeen; ururkii intiisii kalena waxay daba socdeen
sanduuqii Rabbiga, wadaaddaduna waxay afuufayeen
buunankii intay socdeen. 14 Oo maalintii labaadna mar
bay ku soo wareegeen magaaladii, oo waxay ku noqdeen
xeradii; oo sidaasay intii lix maalmood ah yeeleen. 15
Oo maalintii toddobaad aroor horay keceen markii waagu
beryay, oo sidii oo kale ayay magaaladii toddoba jeer
ugu soo wareegeen; laakiin maalintaas ayay magaalada
toddoba jeer ku soo wareegeen. 16 Oo markii toddobaad,
markii wadaaddadii afuufeen buunankii ayaa Yashuuca
dadkii ku yidhi, Qayliya, waayo, Rabbigu waa idin siiyey
magaalada. 17 Oo magaalada waa inay xaaraan ka noqoto
cid kale Rabbiga mooyaane, iyada iyo waxa gudaheeda ku

jiraba; waxaa keliyahoo ka noolaanaya dhillada la yidhaahdo
Raxab iyo inta guriga kula jirta oo dhan, maxaa yeelay,
waxay qarisay basaasyadii aannu dirnay. 18 Oo idinku
waa inaad si walba isaga dhawrtaan waxa la xarrimay,
waayo, waaba intaasoo markii aad xarrintaan, aad haddana
wax ka qaadataan alaabtii la xarrimay. Sidaas haddaad
yeeshaan waxaad xaaraan ka dhigi doontaan oo aad dhibi
doontaan xerada reer binu Israa'iil. 19 Laakiinse lacagta,
iyo dahabka, iyo alaabta naxaasta iyo birta ah oo dhammu
waxay quduus u yihiin Rabbiga, oo iyaga waa in la soo
geliyaa khasnadda Rabbiga. 20 Sidaas daraaddeed dadkii
way qayliyeen, oo wadaaddadiina buunankii bay afuufeen,
oo markii dadkii maqleen dhawaaqii buunka ayaa dadkii ku
qayliyey qaylo dheer, oo markaasaa derbigii meeshiisii ku
dhacay, oo sidaasay dadkiina ku galeen magaaladii, oo nin
waluba hortiisuu qummaati ugu socday, oo magaaladii bay
qaateen. 21 Markaasay wax alla wixii magaalada ku jiray
wada baabbi'iyeen, raggii iyo dumarkii, iyo dhallinyaradii iyo
kuwii da'da weynaaba, iyo dibidii iyo idihii, iyo dameerradiiba,
kulli waxay ku laayeen seef. 22 Oo Yashuuca wuxuu ku yidhi
labadii nin oo dalka soo basaastay, Gurigii dhillada gala, oo
ka soo bixiya naagtii, iyo wax alla waxa ay haysato sidii
aad iyada ugu dhaarateen. 23 Oo markaasay dhallinyaradii
basaasyada ahaa gurigii galeen oo soo bixiyeen Raxab,
iyo aabbeheed iyo hooyadeed, iyo walaalaheed, iyo wixii
ay haysatay oo dhan, oo qaraabadeedii oo dhanna way
soo bixiyeen, oo waxay geeyeen xeradii reer binu Israa'iil
dibaddeeda. 24 Markaasay magaaladii iyo wixii ku jirayba
dab ku gubeen, oo waxay keliyahoo khasnaddii Rabbiga
geliyeen lacagtii iyo dahabkii, iyo alaabtii naxaasta iyo birta
ahayd. 25 Laakiinse wuxuu Yashuuca badbaadiyey dhilladii
Raxab, iyo reerkii aabbeheed, iyo wixii ay haysatay oo dhan,
oo ilaa maantadan la joogo waxay dhex deggan tahay reer
binu Israa'iil, waayo, waxay qarisay basaasyadii Yashuuca u
diray inay Yerixoo soo basaasaan. 26 Markaasaa Yashuuca
dhaariyey, oo wuxuu iyagii ku amray, oo ku yidhi, Kii kaca
oo dhisa magaalada Yerixoo Rabbiga hortiisa inkaaru ha
ku dhacdo. Markuu aasaaskeeda dhigo curadkiisuu waayi
doonaa, markuu irdaheeda dhisona wiilkiisa ugu yar. 27
Haddaba Rabbigu wuxuu la jiray Yashuuca, oo warkiisiina
wuxuu gaadhay dalkii oo dhan.

**7** Laakiinse reer binu Israa'iil waxay ku xadgudbeen alaabtii
la xarrimay, waayo, waxaa alaabtii la xarrimay qaar
qaatay Caakaan ina Karmii, ina Sabdii, oo ahaa ina Serax,
oo ahaa qabiilka Yahuudah; oo markaasaa Rabbigu aad
ugu cadhooday reer binu Israa'iil. 2 Oo Yashuuca wuxuu
niman ka diray Yerixoo oo u diray Aacii, taasoo ku tiil
Beytaawen dhinaceeda, oo xagga bari ka jirtay Beytel. Oo
intuu la hadlay wuxuu iyagii ku yidhi, Bal taga oo dalka
soo basaasa. Oo nimankii intay tageen ayay Aacii soo
basaaseen. 3 Oo markaasay Yashuuca ku soo noqdeen, oo
waxay ku yidhaahdeen, Dadka oo dhammu yaanay wada
tegin; laakiinse laba ama saddex kun oo nin ha tageen,
oo ha baabbi'iyeen Aacii; oo dadka oo dhan halkaas ha
ku daalin, maxaa yeelay, iyagu way yar yihiin. 4 Sidaas
daraaddeed waxaa dadkii ka tegey oo halkaas u kacay in
saddex kun oo nin ku dhow, oo waxay ka hor baqdeen dadkii
reer Aacii. 5 Oo markaasaa dadkii reer Aacii waxay iyagii ka
laayeen lix iyo soddon nin; oo magaalada iriddeedii ayay ka
eryadeen tan iyo Shebaariim, oo waxay ku laayeen meesha
dhaadhaca ah, markaasaa dadkii qalbigiisii dhalaalay,
oo biyo oo kale noqday. 6 Markaasaa Yashuuca intuu
dharkiisii jeexjeexay ayuu wejiga dhulka saaray oo wuxuu
ku hor sujuuday sanduuqii Rabbiga tan iyo fiidkii, isaga
iyo waayeellada reer binu Israa'iilba; oo waxay madaxa
iska mariyeen boodh. 7 Markaasaa Yashuuca wuxuu yidhi,
Way, Sayidow, Rabbiyow, ma waxaad dadkan Webi Urdun
uga soo gudbisay inaad nagu riddo gacmaha reer Amor
iyo inaad na halligto? Waxaa noo wanaagsanaan lahaa
inaannu degno Webi Urdun shishadiisa oo halkaas raalli
ku ahaanno. 8 Sayidow, maxaan idhaahdaa mar hadday
reer binu Israa'iil cadaawayaashoodii dhabarka u jeediyeen?
9 Maxaa yeelay, reer Kancaan iyo kuwa dalka deggan oo
dhammu waxay maqli doonaan warkaas, oo markaasay
na hareerayn doonaan oo ay magacayaga dhulka ka tiri
doonaan; oo markaas maxaad u samaynaysaa magacaaga
weyn? 10 Markaasaa Rabbigu wuxuu Yashuuca ku yidhi,
Sara joogso, maxaad sidaas wejigaaga isugu tuurtay? 11
Reer binu Israa'iil way dembaabeen; xataa weliba waxay ku
xadgudbeen axdigaygii aan iyaga ku amray; xataa waxay
wax ka qaadeen alaabtii la xarrimay, oo wax bay xadeen,
khiyaanana way sameeyeen, oo waxay weliba ku dhex
darsadeen alaabtoodii. 12 Oo sidaas daraaddeed reer
binu Israa'iil cadaawayaashooda isma hor taagi karaan, oo
cadaawayaashooday dhabarka u jeediyeen, maxaa yeelay,
waxay noqdeen wax la xarrimay. Anigu mar dambe idinla jiri
maayo, inaad alaabtii la xarrimay dhexdiinna ka baabbi'isaan
mooyaane. 13 Kac, oo dadka quduus ka dhig, oo waxaad
ku tidhaahdaa, Berri quduus iska dhiga, waayo, Rabbiga
ah Ilaaha Israa'iil wuxuu leeyahay, Reer binu Israa'iilow,
waxaa idinku dhex jira alaab la xarrimay, oo isma aad hor
taagi kartaan cadaawayaashiinna, ilaa aad dhexdiinna ka
fogaysaan alaabtii la xarrimay. 14 Haddaba aroorta waxaa

laydiin soo dhowayn doonaa qabiil qabiil, oo qabiilkii Rabbigu
soo sooco ha ii soo dhowaado iyagoo reer reer ah; oo
haddana reerkii Rabbigu soo sooco, ha iigu soo dhowaadeen
xaas xaas; oo haddana xaaskii Rabbigu soo sooco nin nin
ha iigu soo dhowaadeen. **15** Oo kii laga helo alaabtii la
xarrimay dab baa lagu gubi doonaa isaga iyo wuxuu haysto
oo dhanba; maxaa yeelay, wuxuu ku xadgudbay axdigii
Rabbiga, oo wuxuu reer binu Israa'iilna ku dhex sameeyey
xumaan. **16** Markaasaa Yashuuca wuxuu kacay aroor hore,
oo wuxuu reer binu Israa'iil u soo dhoweeyey qabiil qabiil,
oo markaasaa waxaa la soocay qabiilkii Yahuudah. **17**
Markaasuu hadda wuxuu soo dhoweeyey qabiilkii Yahuudah;
oo wuxuu ka soocay reerkii Serax. Markaasuu xaaskii Serax
u soo dhoweeyey nin nin, oo waxaa lala baxay Sabdii. **18**
Markaasuu reerkiisii nin nin u soo dhoweeyey, kolkaasaa
waxaa la soocay Caakaan ina Karmii, ina Sabdii, oo ahaa
ina Serax ee qabiilkiisuna ahaa Yahuudah. **19** Markaasaa
Yashuuca wuxuu Caakaan ku yidhi, Wiilkaygiiyow, waan ku
baryayaaye, Rabbiga ah Ilaaha reer binu Israa'iil ammaan,
oo isaga wax u qiro; oo anna hadda ii sheeg waxaad
samaysay, oo ha iga qarinin. **20** Markaasaa Caakaan
wuxuu Yashuuca ugu jawaabay, Sida runta ah waan ku
dembaabay Rabbiga ah Ilaaha reer binu Israa'iil, oo waxaan
sameeyey sidaas iyo sidaas: **21** markaan alaabtii boolida
ahayd ku dhex arkay dhar wanaagsan oo Baabuloon laga
keenay, iyo laba boqol oo sheqel oo lacag ah, iyo waslad
dahab ah oo miisaankeedu yahay konton sheqel ayaan
damcay, oo qaatay, oo bal eeg waxay haatan ku qarsoon
yihiin dhulka meel teendhadayda dhexdeeda ah, lacagtuna
way ka hoosaysaa. **22** Markaasaa Yashuuca cid u diray,
oo teendhaday ku ordeen, oo bal eeg, alaabtii waxay ku
qarsoonayd teendhadiisii, oo waxaa ka hoosaysay lacagtii.
**23** Oo markaasay ka bixiyeen teendhadii dhexdeedii, oo
waxay u keeneen Yashuuca, iyo reer binu Israa'iil oo dhan,
oo waxay hor dhigeen Rabbiga. **24** Markaasaa Yashuuca iyo
reer binu Israa'iil oo dhan oo isaga la jira waxay qaadeen
Caakaan ina Serax, iyo lacagtii, iyo dharkii, iyo wasladdii
dahabka ahayd, iyo Caakaan wiilashiisii, iyo gabdhihiisii, iyo
dibidiisii, iyo dameerradiisii, iyo idihiisii, iyo teendhadiisii,
iyo wixii uu haystay oo dhan; oo waxay keeneen dooxadii
Caakoor. **25** Markaasaa Yashuuca wuxuu yidhi, War maxaad
noo dhibtay? Rabbiguna maantuu ku dhibi doonaaye.
Markaasaa reer binu Israa'iil oo dhammu waxay isaga la
dheceen dhagaxyo; oo haddana waxay iyaga ku gubeen
dab, oo dhagaxyona way la dheceen. **26** Oo waxay ku kor
tuuleen dhagaxyo badan oo jira ilaa maantadan la joogo.
Markaasaa Rabbigu ka soo noqday cadhadiisii kululayd.
Sidaas daraaddeed meeshaas magaceedii waxaa loo bixiyey
Dooxadii Caakoor, oo waa loo yaqaanna ilaa maantadan la
joogo.

**8** Markaasaa Rabbigu wuxuu Yashuuca ku yidhi, Ha
cabsan, hana qalbi jabin. Ragga dagaalyahannada ah
oo dhan kaxayso, oo kac oo waxaad tagtaa xagga Aacii,
oo bal eeg, adigaan gacanta ku geliyey boqorka Aacii, iyo
dadkiisa, iyo magaaladiisa, iyo dalkiisaba; **2** oo Aacii iyo
boqorkeedaba waxaad ku samaysaa wixii aad ku samaysay
Yerixoo iyo boqorkeedii; alaabteeda iyo xoolaheedase waa
inaad dhacdaan oo qaadataan. Oo magaalada xagga dambe
ka gaad. **3** Sidaas daraaddeed Yashuuca waa kacay,
isagii iyo raggii dagaalyahannada ahaa oo dhammu, si
ay Aacii u tagaan, oo Yashuuca wuxuu dooray soddon
kun oo nin oo ah rag xoog leh, oo wuxuu diray goor
habeennimo ah. **4** Oo wuxuu ku amray oo ku yidhi, Bal
maqla, waxaad gaaddaan magaalada xaggeeda dambe, oo
ha ka fogaanina magaalada, laakiinse kulligiin diyaar ahaada;
**5** oo aniga iyo dadka ila jira oo dhammuba waxaannu u
dhowaan doonnaa magaalada, oo markay dibadda noogu
soo baxaan sida kolkii ugu horraysay, waannu ka carari
doonnaa hortooda. **6** Markaasay na soo eryan doonaan
ilaa aannu iyaga magaalada ka fogayno; waayo, waxay
is-odhan doonaan, Sidii markii ugu horraysay bay naga
cararayaan, oo sidaasaannu uga hor carari doonnaa iyaga.
**7** Oo markaas waa inaad gaadmada ka timaadaan, oo aad
magaalada qabsataan, waayo, Rabbiga Ilaahiinna ah ayaa
gacanta idiin gelin doona iyada. **8** Oo markii aad magaalada
qabsataan, waa inaad dab qabadsiisaan magaalada, oo
waxaad yeeshaan si waafaqsan ereyga Rabbiga; bal eega,
sidaasaan idinku amraye. **9** Markaasaa Yashuuca iyagii
diray; oo waxay tageen meeshii gaadmada, oo waxay
joogeen meel u dhaxaysa Beytel iyo Aacii, oo galbeed ka
xigta Aacii; laakiinse habeenkaas Yashuuca dadkii buu ku
dhex baryay. **10** Kolkaasaa Yashuuca aroor hore kacay,
oo dadkii isu ururiyey, oo isagii iyo waayeelladii reer binu
Israa'iil waxay dadkii u hor kaceen xaggii Aacii. **11** Oo dadkii
dagaalyahannada ahaa oo dhan oo ah kuwii isaga la jiray
way wada tageen oo intay soo dhowaadeen ayay magaaladii
hor yimaadeen, oo waxay degeen dhinaca woqooyi oo Aacii;
oo dooxo baa u dhexaysay isaga iyo Aacii. **12** Markaasuu
wuxuu kaxaystay rag shan kun ku dhow, oo wuxuu gaadmo
u diray meel u dhexaysa Beytel iyo Aacii, oo magaalada ka
xigta xagga galbeed. **13** Markaasay diyaariyeen dadkii oo
dhan, xataa ciidankii magaalada xagga woqooyi ka xigay oo
dhan, iyo kuwoodii gaadmada ugu qarsoonaa magaalada

xaggeeda galbeed, oo Yashuucana habeenkaas wuxuu
dhaxay dooxadii dhexdeeda. 14 Oo markii boqorkii Aacii
taas arkay, ayay isaga iyo dadkiisa oo dhammu aroor hore
keceen oo dhaqsadeen, oo markaasay dadkii magaaladu
dagaal ugu bexeen reer binu Israa'iil wakhtigii la yidhi, oo
waxay wada tageen meel ka horraysa Caraabaah, laakiinse
ma uu ogayn in rag gaadmo ugu qarsoon yahay magaalada
dabadeeda. 15 Markaasaa Yashuuca iyo reer binu Israa'iil oo
dhammu waxay iska dhigeen sidii iyagoo laga adkaaday, oo
waxay ku carareen xaggii jidka cidlada. 16 Markaasaa dadkii
magaalada joogay oo dhan waxaa loogu wada yeedhay inay
eryadaan reer binu Israa'iil, oo intay Yashuuca eryanayeen
ayaa iyagii laga fogeeyey magaaladii. 17 Oo nin keliyahu
kuma hadhin Aacii iyo Beytel toona, oo aan daba gelin reer
binu Israa'iil; oo magaaladii oo furan bay ka tageen, oo waxay
eryadeen reer binu Israa'iil. 18 Markaasaa Rabbigu wuxuu
Yashuuca ku yidhi, Waranka gacantaada ku jira xagga Aacii
ku taag, waayo, adigaan gacanta kuu gelin doonaa Aacii.
Markaasaa Yashuuca warankii gacantiisa ku jiray wuxuu
ku taagay xaggii magaalada. 19 Markaasaa haddiiba raggii
gaadmada u qarsoonaa ka soo bexeen meeshoodii ay ku
jireen, oo markuu gacanta taagay ayay haddiiba soo ordeen,
oo waxay galeen magaaladii, wayna qabsadeen; oo intay
dhaqsadeen ayay magaaladii dab qabadsiiyeen. 20 Oo dadkii
reer Aacii markay dib u eegeen ayay waxay arkeen qiiqii
magaalada oo samada kor ugu baxaya, oo mana ay lahayn
xoog ay ugu cararaan xaggan ama xaggaa; oo dadkii u
cararay xagga cidlada waxay dib ugu soo jeesteen raacdadii
daba joogtay. 21 Oo markii Yashuuca iyo reer binu Israa'iil
oo dhammu arkeen in raggii gaadmada ahaa ay magaaladii
qabsadeen, iyo in magaalada qiiqeedii kor u baxay, ayay
dib u soo noqdeen, oo waxay laayeen dadkii reer Aacii. 22
Oo kuwii kalena waxay iyaga kaga soo bexeen magaaladii,
sidaas daraaddeed waxay ku dhex jireen reer binu Israa'iil,
iyadoo qaarna dhinacan ka xigo, qaarna dhinacaas ka xigo;
oo way wada laayeen, oo midna kama reebin, qofna kama
baxsan. 23 Oo boqorkii Aacii isagoo nool bay qabteen,
oo waxay u keeneen Yashuuca. 24 Oo markii reer binu
Israa'iil dhammeeyeen oo ay dadkii Aacii degganaan jiray
ku wada laayeen duurkii, iyo cidladii ay u eryadeen, oo
ay seef ku wada le'deen ilaa ay wada baabbe'een, ayaa
reer binu Israa'iil oo dhammu waxay ku soo noqdeen Aacii
xaggeedii, oo waxay ku laayeen seef. 25 Oo intii maalintaas
le'atay rag iyo dumarba waxay ahaayeen laba iyo toban kun,
oo intaasuna waxay ahayd dadkii reer Aacii oo dhan. 26
Waayo, Yashuuca gacantii uu waranka ku taagay dib uma
celin ilaa uu wada baabbi'iyey dadkii Aacii degganaa oo
dhan. 27 Oo reer binu Israa'iil waxay keliyahoo dheceen
xoolihii iyo alaabtii magaalada, sidii erayga Rabbiga uu
Yashuuca ku amray ahaa. 28 Sidaasaa Yashuuca u gubay
Aacii, oo wuxuu ka dhigay tuulmo cidla weligeed ah ilaa
maantadan la joogo. 29 Oo boqorkii Aaciina geed buu ka soo
deldelay, oo wuxuu sudhnaa ilaa makhribkii, oo qorraxdhicii
ayaa Yashuuca amray, markaasay meydkiisii geedkii ka
soo dejiyeen, oo waxay ku tuureen iridda magaalada laga
soo galo, oo waxay ku tuuleen dhagaxyo badan oo jira ilaa
maantadan. 30 Markaasaa Yashuuca wuxuu Rabbiga ah
Ilaaha reer binu Israa'iil Buur Ceebaal uga dhisay meel
allabari, 31 sidii addoonkii Rabbiga oo Muuse ahaa reer
binu Israa'iil ugu amray, iyo sida ku qoran kitaabkii sharciga
Muuse, oo waxay ahayd meel allabari oo ah dhagaxyo aan
la qorin oo aan ninna bir u qaadin; oo waxay Rabbiga ugu
kor bixiyeen qurbaanno la gubo, iyo qurbaanno nabaadiino.
32 Oo wuxuu dhagaxyadii ku qoray naqil sharcigii Muuse ah
oo uu ku qoray reer binu Israa'iil hortooda. 33 Oo reer binu
Israa'iil oo dhan iyo waayeelladoodii, iyo saraakiishoodii,
iyo xaakinnadoodiiba, waxay istaageen sanduuqii dhankiisa
shishe iyo dhankiisa soke oo ka horreeya wadaaddada reer
Laawi oo siday sanduuqii axdiga Rabbiga, qariibka iyo kii
waddanka ku dhashayba, oo badhkood wuxuu is-hor taagay
Buur Gerisiim, badhkoodii kalena wuxuu is-hor taagay Buur
Ceebaal sidii addoonkii Rabbiga oo Muuse ahaa ku amray
inay marka hore u duceeyaan reer binu Israa'iil. 34 Oo
dabadeedna wuxuu akhriyey erayadii sharciga oo dhan,
ducadii iyo habaarkiiba, siday ahaayeen wixii ku qornaa
kitaabkii sharciga oo dhan. 35 Oo ma jirin eray Muuse amray
oo aan Yashuuca ku hor akhriyin shirkii reer binu Israa'iil oo
dhan, iyo dumarkii, iyo dhallaankii, iyo kuwii qariibka ahaa
oo iyaga dhex socdayba.

9 Oo Webi Urdun shishadiisa, iyo dhulka buuraha, iyo
dhulka dooxada ah, iyo badda weyn xeebteeda oo ka
horraysa Lubnaan boqorradii degganaa oo dhammu markay
maqleen, waxaa dhacday inay reer Xeed, iyo reer Amor, iyo
reer Kancaan, iyo reer Feris, iyo reer Xiwi, iyo reer Yebuusba
2 iswada urursadeen inay isku si ula diriraan Yashuuca iyo
reer binu Israa'iil. 3 Laakiinse dadkii Gibecoon degganaa
markay maqleen wixii Yashuuca ku sameeyey Yerixoo iyo
Aacii, 4 iyana markaasay khiyaano sameeyeen, oo intay
tageen bay iska dhigeen sidii iyagoo ah wakiillo dalal kale,
oo waxay dameerradoodii ku qaateen joonyado gaboobay,
iyo sibraarro khamri oo khamri oo gaboobay oo dildillaacay
oo la xidhxidhay. 5 Oo waxay gashadeen kabo duugoobay
oo la karkaray, oo waxay xidheen dhar gaboobay, oo kibistii

ay soo sahaydeen oo dhammuna waxay ahayd mid engegan
oo caaryaysatay. **6** Oo waxay u tageen Yashuuca oo jooga
xeradii ku tiil Gilgaal, oo waxay ku yidhaahdeen isagii iyo
raggii reer binu Israa'iilba, Annagu waxaannu ka nimid dal
fog; haddaba sidaas daraaddeed axdi nala dhigta. **7** Oo
raggii reer binu Israa'iil waxay ku yidhaahdeen kuwii reer
Xiwi, War mindhaa annagaad na dhex deggan tihiin, oo
haddaba sidee baannu axdi idiinla dhiganaynaa? **8** Oo
waxay Yashuuca ku yidhaahdeen, Annagu waxaannu nahay
addoommadaada. Markaasaa Yashuuca wuxuu ku yidhi,
Yaad tihiin? Oo xaggee baad ka timaadeen? **9** Kolkaasay
waxay isagii ku yidhaahdeen, Magaca Rabbiga Ilaahaaga ah
aawadiis ayaannu annagoo addoommadaada ah waddan
aad u fog uga nimid, waayo, waxaannu maqalnay warkiisii,
iyo kulli wixii uu Masar ku dhex sameeyey oo dhan, **10** iyo
kulli wixii uu ku sameeyey labadii boqor oo reer Amor oo ka
shisheeyey Webi Urdun, kuwaas oo ahaa Siixon oo boqor
ka ahaa Xeshboon, iyo Coog oo boqor ka ahaa Baashaan,
oo degganaa Cashtarod. **11** Oo odayaashayadii iyo dadkii
waddankayaga degganaa oo dhammu waxay nagu soo
yidhaahdeen, Sodcaalka aawadiis sahay u qaata, oo taga si
aad ula kulantaan iyaga, oo waxaad ku tidhaahdaan, Annagu
waxaannu nahay addoommadiinna, ee haddaba axdi nala
dhigta. **12** Oo kibistan iyadoo kulul baan guryahayagii sahay
uga soo qaadannay maalintii aan idiin soo kacnay; laakiinse
bal hadda eega, way engegtay, wayna caaryaysatay: **13**
oo sibraarradan khamriga oo aannu soo buuxsannay way
cusbaayeen, oo bal eega haatan waa dildillaacsan yihiin,
oo dharkayaga iyo kabahayagu waxay ku duugoobeen
sodcaalkii aad u dheeraa aawadiis. **14** Oo markaasay
nimankii wax ka qaateen sahaydoodii, oo Rabbigana talo ma
ay weyddiisan. **15** Oo Yashuucana wuu la nabday iyagii, oo
axdina wuu la dhigtay inuu naftooda u daayo; oo amiirradii
shirkuna way u dhaarteen iyagii. **16** Oo markay axdigii la
dhigteen saddex maalmood dabadeed waxay maqleen inay
yihiin deriskooda, oo ay dhexdooda deggan yihiin. **17** Oo reer
binu Israa'iil way sodcaaleen, oo maalintii saddexaad waxay
yimaadeen magaalooyinkoodii. Oo magaalooyinkooduna
waxay ahaayeen Gibecoon, iyo Kefiiraah, iyo Bi'irod, iyo
Qiryad Yecaariim. **18** Oo reer binu Israa'iilna ma ay layn,
waayo, amiirradii shirku waxay iyagii ugu dhaarteen Rabbiga
ah Ilaaha reer binu Israa'iil. Oo markaasaa shirkii oo dhammu
waxay ka gunuunaceen amiirradii. **19** Laakiinse amiirradii oo
dhammu waxay shirkii oo dhan ku yidhaahdeen, Waxaannu
iyaga ugu dhaarannay Rabbiga ah Ilaaha reer binu Israa'iil;
oo haddaba sidaas daraaddeed waa inaynaan taaban
iyaga. **20** Oo sidan baan u yeelaynaa, oo naftooda ayaan u
daynaynaa waaba intaas oo dhaartii aannu ugu dhaarannay
daraaddeed cadho inoogu dhacdaaye. **21** Oo amiirradii
waxay ku yidhaahdeen, Naftooda u daaya, ha noolaadeene.
Sidaas daraaddeed waxay shirkii oo dhan u noqdeen kuwo
xaabada gura oo biyaha dhaansha, sidii amiirradii kula
hadleen iyagii. **22** Markaasaa Yashuuca u yeedhay iyagii, oo
intuu la hadlay buu ku yidhi, War maxaad noo khiyaanayseen
oo noogu tidhaahdeen, Waannu idinka fog nahay, idinkoo
na dhex deggan? **23** Sidaas daraaddeed waad habaaran
tihiin, oo weligiin laydinka waayi maayo addoommo ah kuwa
xaabada u gura, biyahana u dhaamiya guriga Ilaahayga. **24**
Oo waxay Yashuuca ugu jawaabeen, Maxaa yeelay, hubaal
waxaa annagoo addoommadaada ah lanoo sheegay sida
Rabbiga Ilaahaaga ahu addoonkiisii Muuse ahaa ugu amray
inuu idin siiyo dalka oo dhan, iyo in dadka dalka deggan
oo dhan hortiinna laga baabbi'iyo; oo sidaas aawadeed
naftayada aad baannu ugu cabsannay idinka daraaddiin,
oo waxanna sidaas baannu u yeelnay. **25** Oo haddaba bal
eeg gacantaadaannu ku jirnaa. Sidii kula wanaagsan oo
kula qumman inaad nagu samaysid yeel. **26** Oo sidaas
buu u yeelay, oo ka samatabbixiyey gacantii reer binu
Israa'iil inaanay dilin. **27** Oo maalintaasuu Yashuuca iyagii ka
dhigay kuwo xaabada u gura, biyahana u dhaamiya shirka
iyo meesha allabariga Rabbiga, taas oo ku taal meel alla
meeshuu doortoba, ilaa maantadan la joogo.

**10** Oo boqorkii Yeruusaalem oo Adonii Sedeq ahaa
markuu maqlay siduu Yashuuca Aacii u qabsaday,
oo uu dhammaanteed u baabbi'iyey, iyo siduu Yerixoo
iyo boqorkeediiba ku sameeyey, oo uu haddana sidaas
oo kale ku sameeyey Aacii iyo boqorkeediiba, iyo siday
dadkii Gibecoon degganaa oo ku dhex jiray ula nabdeen
reer binu Israa'iil, **2** ayuu aad u cabsaday, maxaa yeelay,
Gibecoon waxay ahayd magaalo weyn sida mid ka mid ah
magaalooyinka boqorrada, waayo, way ka sii weynayd Aacii,
oo dadkeeda oo dhammuna waa xoog badnaayeen. **3** Sidaas
daraaddeed boqorkii Yeruusaalem oo ahaa Adonii Sedeq
wuxuu u cid diray boqorkii Xebroon oo ahaa Hoohaam, iyo
boqorkii Yarmuud oo ahaa Firaam, iyo boqorkii Laakiish
oo ahaa Yaafiica, iyo boqorkii Cegloon oo ahaa Debiir, oo
wuxuu ku yidhi, **4** Ii kaalaya, oo i caawiya, oo ina keena
aynu Gibecoon baabbi'innee; waayo, waxay la nabadday
Yashuuca iyo reer binu Israa'iil. **5** Sidaas daraaddeed
shantii boqor oo reer Amor waa iswada urursadeen, oo
kuwaasu waxay ahaayeen boqorkii Yeruusaalem, iyo boqorkii
Xebroon, iyo boqorkii Yarmuud, iyo boqorkii Laakiish, iyo
boqorkii Cegloon; iyaga iyo ciidammadooda oo dhammu

kor bay u bixiyeen oo waxay hor degeen Gibecoon oo
dagaal ku qaadeen. **6** Oo dadkii reer Gibecoon waxay u cid
dirteen Yashuuca oo joogay xeradii Gilgaal, oo waxay ku
yidhaahdeen, Gacantaadu yay ka raagin addoommadaada,
noo soo dhaqso, oo na badbaadi, oo na caawi: maxaa
yeelay, boqorradii reer Amor oo buuraha degganaa oo
dhammu way isu kaayo urursadeen. **7** Sidaas daraaddeed
Yashuuca wuxuu ka tegey Gilgaal isagoo ay la socdaan dadkii
dagaalyahannada ahaa oo dhan iyo raggii xoogga lahaa oo
dhammuba. **8** Oo markaasaa Rabbigu wuxuu Yashuuca ku
yidhi, Iyaga ha ka cabsan, waayo, iyaga gacmahaagaan
kuu soo geliyey. Midkoodna isma kaa hor taagi doono.
**9** Oo sidaas daraaddeed Yashuuca ayaa ku soo kediyey
iyagii, waayo, habeenkii oo dhan buu ka soo guuraynayay
Gilgaal. **10** Oo markaasaa Rabbigu cabsi ku riday iyagii
reer binu Israa'iil hortooda, oo Gibecoon agteeda ayuu aad
ugu laayay, oo wuxuu u eryaday xagga jidkii kor loo baxo
Beytxooroon, oo wuxuu ku laynayay ilaa Caseeqaah iyo tan
iyo Maqeedaah. **11** Oo markay ka carareen reer binu Israa'iil,
intay ku sii jireen dhaadhaca Beytxooroon, ayaa Rabbigu
wuxuu iyaga samada kaga soo daayay roob dhagaxyo leh oo
waaweyn ilaa Caseeqaah, oo way dhinteen; oo intii roobkii
dhagaxyada lahaa ku dhimatay baa ka sii badnayd intoodii
reer binu Israa'iil seefta ku laayeen. **12** Markaasaa Yashuuca
Rabbiga la hadlay maalintii Rabbigu reer Amor u dhiibay
reer binu Israa'iil, oo wuxuu reer binu Israa'iil hortooda
ka yidhi, Qorraxday, istaag Gibecoon korkeeda, Adiguna,
Dayaxow, waxaad kor istaagtaa dooxada Ayaaloon. **13** Oo
markaasaa qorraxdii istaagtay; dayaxiina waa joogsaday, Ilaa
ay quruuntii ka aarsatay cadaawayaashoodii. Tanu miyaanay
ku qornayn kitaabkii Yaashaar? Oo qorraxdii waxay ku
joogsatay samada dhexdeeda, umana ay degdegin inay
hoos u dhacdo maalin dhan. **14** Oo maalintaas maalin la mid
ahu kamana horrayn, kamana dambayn, ee uu Rabbigu
maqlay nin codkiis: waayo, Rabbigu wuxuu u diriray reer
binu Israa'iil. **15** Markaasaa Yashuuca iyo reer binu Israa'iil
oo dhammu waxay ku noqdeen xeradii ku tiil Gilgaal. **16**
Kolkaasaa shantii boqor carartay, oo waxay ku dhuunteen
godkii ku yiil Maqeedaah. **17** Oo markaasaa Yashuuca loo
sheegay, oo waxaa lagu yidhi, Shantii boqor waxaa la helay
iyagoo ku qarsoon god ku yaal Maqeedaah. **18** Markaasuu
Yashuuca yidhi, Dhagaxyo waaweyn ku giringiriya godka
afiisa, oo rag dhawrana ag taaga; **19** laakiinse intiinna kale
ha joogsanina; ee cadaawayaashiinna eryada, oo laaya
intooda ugu dambaysa, oo ha u oggolaanina inay galaan
magaalooyinkooda; waayo, Rabbiga Ilaahiinna ah ayaa
iyaga gacanta idiin geliyey. **20** Oo markii Yashuuca iyo
reer binu Israa'iil ay dhammeeyeen layntii weynayd ee ay
raggii laayeen, ilaa ay wada baabbi'iyeen oo firxadkii ka
soo hadhayna ay galeen magaalooyinkii deyrarka lahaa,
**21** ayaa dadkii oo dhammu nabdoonaan ku soo noqdeen
Yashuuca oo joogay xeradii ku tiil Maqeedaah, oo mid
qudh ahu afka uma kala qaadin reer binu Israa'iil. **22** Oo
markaasuu Yashuuca yidhi, Godka afkiisa banneeya oo
shantii boqor ka soo bixiya godkii oo ii keena. **23** Kolkaasay
sidii yeeleen, oo waxay isagii u keeneen shantii boqor
oo ay ka soo bixiyeen godkii, kuwaas oo ahaa boqorkii
Yeruusaalem, iyo boqorkii Xebroon, iyo boqorkii Yarmuud,
iyo boqorkii Laakiish, iyo boqorkii Cegloon. **24** Oo markay
boqorradii u keeneen Yashuuca ayuu u yeedhay raggii reer
binu Israa'iil oo dhan, oo wuxuu raggii dagaalyahannada
ahaa oo isaga raacay madaxdoodii ku yidhi, Soo dhowaada,
oo boqorradan qoorta kaga joogsada. Oo kolkaasay soo
dhowaadeen, oo boqorradii qoorta kaga joogsadeen. **25**
Markaasaa Yashuuca wuxuu iyagii ku yidhi, Ha cabsanina,
hana qalbi jabina; xoog yeesha oo aad u dhiirranaada;
waayo, Rabbigu sidaasuu u geli doonaa cadaawayaashiinna
aad la diriraysaan oo dhan. **26** Oo markaas dabadeed ayuu
Yashuuca wada laayay, oo uu shan geed ka soo deldelay, oo
waxay geedihii ka soo laalaadeen ilaa fiidkii. **27** Oo kolkay
qorraxdu dhacday ayaa Yashuuca amray in laga soo dejiyo
geedihii, oo kolkaasay ku tuureen godkii ay markii hore ku
dhuunteen, oo markaasay dhagaxyo waaweyn godkii afkiisii
saareen, oo waa sidii ilaa maantadan. **28** Oo Yashuuca
maalintaasuu qabsaday Maqeedaah, oo wuxuu dadkeedii
ku laayay seef, iyo xataa boqorkeedii; oo dadkii ku jiray oo
dhan wuu wada baabbi'iyey, oo waxba kama uu reebin,
oo boqorkii Maqeedaah wuxuu ku sameeyey sidii uu ku
sameeyey boqorkii Yerixoo. **29** Oo Yashuuca iyo reer binu
Israa'iil oo dhammu way dhaafeen Maqeedaah oo waxay
tageen Libnaah, oo la dirireen reer Libnaah; **30** oo Rabbigu
iyada iyo boqorkeediiba wuxuu gacanta u geliyey reer binu
Israa'iil, oo wuxuu seef ku laayay iyada iyo dadkii ku jiray oo
dhan, oo waxba kama uu reebin, oo boqorkeediina wuxuu
ku sameeyey sidii uu ku sameeyey boqorkii Yerixoo. **31** Oo
Yashuuca iyo reer binu Israa'iil oo dhammu way dhaafeen
Libnaah, oo waxay tageen Laakiish, kolkaasay degeen
meel ka soo hor jeedda oo dagaal ku qaadeen; **32** oo
Rabbigu wuxuu Laakiish geliyey gacantii reer binu Israa'iil,
oo wuxuu iyana qabsaday maalintii labaad, oo dadkii ku
jiray oo dhan wuxuu ku laayay seef, oo wuxuu u galay sidii
uu Libnaah u galay oo kale. **33** Markaasaa Laakiish waxaa
u soo hiiliyey boqorkii Geser oo ahaa Horaam, kolkaasaa
Yashuuca laayay isagii iyo dadkiisiiba, ilaa uusan waxba

ka reebin. 34 Markaasay Yashuuca iyo reer binu Israa'iil
oo dhammu dhaafeen Laakiish oo waxay tageen Cegloon;
kolkaasay degeen meel ka soo hor jeedda, oo dagaal ku
qaadeen; 35 oo maalintaasay iyana qabsadeen oo dadkii ku
jiray oo dhan waxay ku laayeen seef, oo maalintaasuu wada
baabbi'iyey, oo wuxuu ku sameeyey sidii uu ku sameeyey
Laakiish oo kale. 36 Markaasaa Yashuuca iyo reer binu
Israa'iil oo dhammu way dhaafeen Cegloon oo waxay tageen
Xebroon, wayna la dirireen, 37 oo iyana way qabsadeen, oo
waxay ku wada laayeen seef dadkeedii iyo boqorkeedii iyo
magaalooyinkeedii oo dhan iyo dadkii ku jiray oo dhanba;
waxba kama reebin, sidii uu Cegloon ku sameeyey oo kale,
laakiinse wuu wada baabbi'iyey iyadii iyo dadkii ku jiray
oo dhanba. 38 Markaasaa Yashuuca iyo reer binu Israa'iil
oo dhammu waxay ku noqdeen Debiir, oo dagaal bay ku
qaadeen. 39 Oo iyana wuu qabsaday, iyo boqorkeedii, iyo
magaalooyinkeediiba, oo waxay ku laayeen seef, oo dadkii
ku jiray oo dhanba way wada baabbi'iyeen oo waxba kama
uu reebin; oo wuxuu Debiir iyo boqorkeediiba ku sameeyey
siduu ku sameeyey Xebroon iyo weliba siduu markii hore
ku sameeyey Libnaah iyo boqorkeediiba. 40 Sidaasuu
Yashuuca u wada laayay dadkii dalkii oo dhan, kaas oo
ahaa waddankii buuraha ahaa, iyo xaggii Koonfureed, iyo
dooxooyinkii, iyo dhaadhacyadii, iyo xataa boqorradoodii
oo dhan, oo waxba kama uu reebin; laakiinse wuu wada
baabbi'iyey intii neefsanaysay oo dhan, sidii uu Rabbiga ah
Ilaaha reer binu Israa'iil ku amray. 41 Oo Yashuuca wuxuu
laayay iyagii ilaa Qaadeesh Barneeca iyo tan iyo Gaasa, iyo
dalkii reer Goshen oo dhan, iyo xataa tan iyo Gibecoon. 42
Oo boqorradaas iyo dalkoodii oo dhan Yashuuca isku mar
buu wada qabsaday, maxaa yeelay, Rabbiga ah Ilaaha reer
binu Israa'iil baa u diriray reer binu Israa'iil. 43 Markaasaa
Yashuuca iyo reer binu Israa'iil oo dhammu waxay ku
noqdeen xeradii ku tiil Gilgaal.

**11** Oo markuu boqorkii Xaasoor oo ahaa Yaabiin waxaas
maqlay ayuu u cid diray boqorkii Maadoon oo ahaa
Yoobaab, iyo boqorkii Akshaaf, 2 iyo boqorradii jiray xagga
woqooyi, kaas oo ahaa dalka buuraha leh, iyo kuwii joogay
xagga ban Caraabaah oo koonfur ka xigta Kinnered, iyo
xagga dooxooyinka, iyo dalka sare oo Door ee xagga
galbeed jira, 3 iyo kuwii reer Kancaan oo jiray bari iyo
galbeedba, iyo reer Amor, iyo reer Xeed, iyo reer Feris, iyo
reer Yebuus oo degganaa dalka buuraha leh, iyo reer Xiwi
oo degganaa dalkii Misfaah oo ka hooseeyey Xermoon. 4
Kolkaasay baxeen, iyagii iyo ciidammadoodii oo la jirayba,
oo waxay ahaayeen dad badan, oo tiradoodu waxay ahayd
sida cammuudda taal badda xeebteeda, waxayna wateen
fardo iyo gaadhifardood aad u badan. 5 Oo boqorradaas oo
dhammu way isu yimaadeen, oo waxay wada degeen biyihii
Meeroom agtooda si ay reer binu Israa'iil ula diriraan. 6
Markaasaa Rabbigu wuxuu Yashuuca ku yidhi, Ha ka cabsan
iyaga, waayo, berri hadda oo kale ayaan reer binu Israa'iil
gacanta u gelin doonaa, iyagoo la wada laayay. Oo waa
inaad fardahooda boqno gooysaa, oo gaadhifardoodkoodana
waa inaad dab ku gubtaa. 7 Markaasay Yashuuca iyo raggii
dagaalyahannada ahaa oo dhammu biyihii Meeroom agtooda
kaga soo kediyeen oo weerareen iyagii. 8 Oo Rabbigu wuxuu
iyagii geliyey gacantii reer binu Israa'iil, oo way laayeen,
oo waxay u eryadeen xagga Siidoonta weyn, iyo xagga
Misrefood Mayim, iyo xagga dooxadii Misfaah oo bari xigta,
oo way laayeen ilaa aanay waxba ka reebin. 9 Oo Yashuuca
wuxuu ku sameeyey iyagii wixii Rabbigu u sheegay; oo
fardahoodii wuu boqno gooyay, oo gaadhifardoodkoodiina
dab buu ku wada gubay. 10 Oo markaasaa Yashuuca dib u
noqday, oo wuxuu qabsaday Xaasoor, oo boqorkeediina
wuxuu ku dilay seef; waayo, markaas ka hor Xaasoor madax
bay u ahaan jirtay boqortooyooyinkaas oo dhan. 11 Oo
dadkii ku jiray oo dhan waxay ku laayeen seef, wayna wada
baabbi'iyeen; oo wax neefsadaa kuma hadhin, Xaasoorna
dab buu ku gubay. 12 Oo Yashuuca wuxuu wada qabsaday
boqorradaas magaalooyinkoodii oo dhan, iyo boqorradoodii
oo dhan, oo wuxuu ku wada laayay seef, oo wuu wada
baabbi'iyey; sidii uu addoonkii Rabbiga oo Muuse ahaa ku
amray. 13 Laakiinse reer binu Israa'iil waxba kama gubin
magaalooyinkii buurahoodii ku yiil, Xaasoor mooyaane,
taasna waxaa gubay Yashuuca. 14 Oo magaalooyinkaas
alaabtoodii oo dhan iyo xoolahoodii oo dhanba reer binu
Israa'iil way dhaceen, laakiinse nin kasta waxay ku dileen
seef ilaa ay wada baabbi'iyeen, oo waxba kama ay reebin
intii neefsatay oo dhan. 15 Wixii Rabbigu addoonkiisii Muuse
ahaa ku amray ayuu Muusena Yashuuca ku amray, oo
Yashuucana sidaasuu yeelay, oo kulli wixii Rabbigu Muuse
ku amray wax aanu samayn ma jirin. 16 Oo Yashuuca wuxuu
qabsaday dalkaas oo dhan, kaas oo ahaa dalkii buuraha
lahaa, iyo Koonfur oo dhan, iyo dalkii Goshen oo dhan,
iyo dalkii dooxada ahaa, iyo bankii Caraabaah, iyo dalkii
reer binu Israa'iil oo buuraha lahaa, iyo intiisii dooxada
ahayd, 17 haddii laga bilaabo Buur Haalaaq, taasoo kor
u kacsan ilaa Seciir, iyo xataa tan iyo Bacal Gaad oo ku
taal dooxadii Lubnaan oo ka hoosaysa Buur Xermoon; oo
wuxuu wada qabsaday boqorradoodii oo dhan, oo intuu
dilay buu wada laayay. 18 Oo Yashuuca wakhti dheer buu la
dirirayay boqorradaas oo dhan. 19 Oo lama arag magaalo la

nabadday reer binu Israa'iil, reer Xiwi oo Gibecoon degganaa
mooyaane: oo dagaal bay kulligood ku wada qabsadeen.
20 Waayo, xagga Rabbiga ayay ka timid inuu qalbigooda
adkeeyo, si ay dagaal ugu soo baxaan reer binu Israa'iil,
oo uu dhammaantood u baabbi'iyo, oo aanay waxba inna
raallinimo ka helin, laakiinse uu u wada baabbi'iyo sidii
Rabbigu Muuse ku amray. 21 Oo markaasaa Yashuuca yimid,
oo wuxuu reer Canaaq ka tiray dalkii buuraha lahaa, kaas oo
ahaa Xebroon, iyo Debiir, iyo Canaab, iyo xaggii dalkii reer
Yahuudah oo buuraha lahaa oo dhan, iyo dalkii reer binu
Israa'iil oo buuraha lahaa oo dhan; oo Yashuuca dhammaan
iyagii iyo magaalooyinkoodiiba wuu wada baabbi'iyey. 22 Oo
dalkii reer binu Israa'iil mid reer Canaaq ahu kuma hadhin,
laakiinse waxaa wuxoogaa ku hadhay Gaasa, iyo Gad, iyo
Ashdood oo keliya. 23 Sidaasuu Yashuuca u wada qabsaday
dalkii oo dhan, oo wuxuu wada yeelay sidii Rabbigu kula
hadlay Muuse; oo Yashuuca wuxuu dalkii dhaxal u siiyey reer
binu Israa'iil, oo wuxuu ugu qaybiyey sidii qabiilooyinkoodu
ahaayeen. Oo dalkiina dagaal wuu ka nastay.

12 Haddaba kuwanu waa boqorradii dalka, oo ay reer binu
Israa'iil laayeen oo ay dalkoodii ka qaateen meel Webi
Urdun ka shishaysa oo qorrax ka soo baxa ka xigta, markii
laga bilaabo dooxadii Arnoon iyo tan iyo Buur Xermoon,
iyo inta banka Caraabaah xagga bari ka xigta oo dhan: 2
oo waxay ahaayeen boqorkii reer Amor oo ahaa Siixon,
oo degganaa Xeshboon, oo xukumi jiray Carooceer oo
ku tiil dooxadii Arnoon darafteeda, iyo magaaladii ku tiil
dooxadii dhexdeeda, iyo Gilecaad badhkeed, iyo tan iyo
Webi Yabboq, kaasoo ku yiil soohdintii reer Cammoon, 3 iyo
bankii Caraabaah iyo tan iyo baddii Kinnered, iyo xagga bari,
iyo tan iyo baddii Caraabaah, taas oo ah Badda Cusbada
leh, oo bari, ee ku taal jidkii Beytyeshimood, ee xagga
koonfureed, ee ka hoosaysay dhaadhacyadii Fisgaah: 4 iyo
xuduudkii Coog oo ahaa boqorkii Baashaan, oo ka hadhay
reer Rafaa ee Cashtarod agteeda joogay, Edrecii agteedana
joogay. 5 Kaasu wuxuu xukumi jiray Buur Xermoon, iyo
Salkaah, iyo Baashaan oo dhan, iyo tan iyo soohdinta reer
Geshuur iyo kan reer Macakaad iyo Gilecaad badhkeed, iyo
xuduudka Siixon oo boqor u ahaa Xeshboon. 6 Addoonkii
Rabbiga oo Muuse ahaa iyo reer binu Israa'iil baa laayay
iyagii, oo addoonkii Rabbiga oo Muuse ahaa ayaa reer
Ruubeen iyo reer Gaad, iyo reer Manaseh badhkood hanti
ahaan u siiyey. 7 Oo kuwanu waa boqorradii Yashuuca
iyo reer binu Israa'iil ka laayeen Webi Urdun shishadiisa
xagga galbeed ka xigta, markii laga bilaaba Bacal Gaad oo
ku tiil dooxadii Lubnaan iyo tan iyo Buur Xaalaaq oo kor
u kacsan Seciir; oo Yashuuca wuxuu siiyey qabiilooyinkii
reer binu Israa'iil, oo hanti ahaan buu ugu qaybiyey, 8
xagga dalkii buuraha lahaa, iyo dalkii dooxooyinka ahaa,
iyo bankii Caraabaah, iyo dhaadhacyadii, iyo cidladii, iyo
xagga Koonfureed, iyo reer Xeed, iyo reer Amor, iyo reer
Kancaan, iyo reer Feris, iyo reer Xiwi, iyo reer Yebuus. 9
Oo waa kuwan boqorradii, boqorkii Yerixoo, iyo boqorkii
Aacii tii u dhowayd Beytel, 10 iyo boqorkii Yeruusaalem,
iyo boqorkii Xebroon, 11 iyo boqorkii Yarmuud, iyo boqorkii
Laakiish, 12 iyo boqorkii Cegloon, iyo boqorkii Geser, 13 iyo
boqorkii Debiir, iyo boqorkii Geder, 14 iyo boqorkii Xormaah,
iyo boqorkii Caraad, 15 iyo boqorkii Libnaah, iyo boqorkii
Cadullaam, 16 iyo boqorkii Maqeedaah, iyo boqorkii Beytel,
17 iyo boqorkii Tafuu'ax iyo boqorkii Heefer, 18 iyo boqorkii
Afeeq, iyo boqorkii Lashaaroon, 19 iyo boqorkii Maadoon,
iyo boqorkii Xaasoor, 20 iyo boqorkii Shimroon Meroon, iyo
boqorkii Akshaaf, 21 iyo boqorkii Tacanaag, iyo boqorkii
Megiddoo, 22 iyo boqorkii Qedesh, iyo boqorkii Yoqnecaam
oo Karmel tiil, 23 iyo boqorkii Door oo ku tiil meesha ugu
dheer Door, iyo boqorkii quruumaha degganaa Gilgaal, 24
iyo boqorkii Tirsaah. Oo boqorradii oo dhammuna waxay
ahaayeen kow iyo soddon.

13 Yashuuca waa da' weynaa, gaboowna wuu la dhacay,
oo kolkaasaa Rabbigu wuxuu isagii ku yidhi, Adigu
waad da' weyn tahay oo gaboowna waad la dhacday,
laakiinse weliba waxaa hadhay dal badan in la hantiyo. 2 Oo
dalka weli hadhay waxa weeye kan: gobollada reer Falastiin
oo dhan iyo reer Geshuur oo dhan, 3 tan iyo Shiixoorta ku
taal Masar horteeda, iyo xataa tan iyo soohdinta Ceqroon ee
xagga woqooyi, ee loo tiriyo reer Kancaan, iyo shanta amiir
ee reer Falastiin oo u taliya reer Gaasa, iyo reer Ashdood,
iyo reer Ashqeloon, iyo reer Gad, iyo reer Ceqroon, 4
iyo xataa reer Caw oo xagga koonfureed xiga, iyo dalka
reer Kancaan oo dhan, iyo Mecaaraah tan ay reer Siidoon
leeyihiin, iyo ilaa Afeeq, iyo tan iyo soohdinta reer Amor, 5
iyo dalka reer Gebal iyo Lubnaan oo dhan, xagga qorrax ka
soo baxa, inta laga bilaabo Bacal Gaad tan ku taal Buur
Xermoon hoosteeda, iyo tan iyo meesha laga galo Xamaad.
6 Dadka deggan dalka buuraha leh oo dhan, tan iyo Lubnaan
iyo ilaa Misrefood Mayim, iyo xataa reer Siidoon oo dhan
kulligood waxaan ka eryi doonaa reer binu Israa'iil hortooda;
laakiinse waa inaad dhaxal ahaan ugu qori riddaa reer
binu Israa'iil sidaan kugu amray. 7 Haddaba dalkan dhaxal
ahaan ugu qaybi sagaalka qabiil iyo qabiilka reer Manaseh
badhkiis, 8 Kuwaasoo ay reer Ruubeen iyo reer Gaadba
la heleen dhaxalkoodii uu Muuse ka siiyey xagga bari oo

Webi Urdun ka shishaysa, xataa sidii addoonkii Rabbiga
oo Muuse ahaa uu u siiyey iyaga, 9 tan iyo Carooceer
oo ku taal dooxadii Arnoon darafkeeda, iyo magaalada ku
taal dooxada dhexdeeda, iyo banka Meedebaa oo dhan
iyo xataa tan iyo Diibon, 10 iyo dhammaan magaalooyinkii
Siixon oo boqor u ahaa reer Amor uu ku xukumi jiray
Xeshboon, tan iyo soohdinta reer Cammoon, 11 iyo Gilecaad,
iyo soohdinta reer Geshuur, iyo reer Macakaad, iyo Buur
Xermoon oo dhan, iyo Baashaan oo dhan iyo ilaa Salkaah,
12 iyo boqortooyadii Baashaan ku tiil oo dhan oo Coog ka
xukumi jiray Cashtarod iyo Edrecii (Isagu wuxuu ka hadhay
reer Rafaa), waayo, kuwaas waxaa laayay Muuse, wuuna
eryay. 13 Habase yeeshee reer binu Israa'iil ma ay eryin reer
Geshuur iyo reer Macakaad toona; laakiinse reer Geshuur
iyo reer Macakaad waxay dhex deggan yihiin reer binu
Israa'iil ilaa maantadan la joogo. 14 Oo waxaanu dhaxal siin
qabiilkii reer Laawi oo keliya. Sidii Rabbigu kula hadlay isaga,
waxaa dhaxal u ahaa qurbaannada loo bixiyo Rabbiga ah
Ilaaha reer binu Israa'iil. 15 Oo Muuse wuxuu reer Ruubeen
qabiilkoodii wax u siiyey sidii reerahoodu ahaayeen. 16 Oo
xuduudkoodu wuxuu ka bilaaban jiray Carooceer taas oo ku
taal dooxada Arnoon darafkeeda, iyo magaalada ku taal
dooxada dhexdeeda, iyo kulli banka Meedebaa u dhow oo
dhan, 17 iyo Xeshboon, iyo kulli magaalooyinkeeda banka
ku yaal oo dhan, kuwaasoo ah, Diibon iyo Baamood Bacal,
iyo Beyd Bacal Mecoon, 18 iyo Yahas, iyo Qedemood,
iyo Mefacad, 19 iyo Qiryatayim, iyo Sibmaah, iyo Sered
Shahar oo ku taal buurta dooxada, 20 iyo Beytfecoor, iyo
dhaadhacyadii Fisgaah, iyo Beytyeshimood, 21 iyo kulli
magaalooyinkii banka oo dhan, iyo boqorkii reer Amor
oo Siixon ahaa boqortooyadiisii oo dhan, kaas oo xukumi
jiray Xeshboon, oo Muuse la dilay madaxdii reer Midyaan,
kuwaasoo ahaa Ewii, iyo Reqem, iyo Suur, iyo Xuur, iyo
Rebac, oo ahaa amiirradii Siixon oo dalkaas degganaa. 22
Weliba faaliyaha Balcaam oo ahaa ina Becoor ayay reer
binu Israa'iil seef kula dileen dadkii kaloo ay laayeen. 23
Reer Ruubeen dalkooduna wuxuu ahaa Urdun, iyo inta
soohdintiisa ah oo dhan. Kanu waa dhaxalkii reer Ruubeen
iyo sidii reerahoodu ahaayeen, iyo magaalooyinkoodii iyo
tuulooyinkoodiiba. 24 Oo Muuse wax buu siiyey qabiilkii reer
Gaad, oo wuxuu wax u siiyey reer Gaad sidii reerahoodu
ahaayeen. 25 Oo xuduudkooduna wuxuu ka koobnaa
Yacser, iyo magaalooyinkii Gilecaad oo dhan, iyo dalkii
reer Cammoon badhkiis, iyo tan iyo Carooceer oo ku hor
taal Rabbaah, 26 iyo ilaa Xeshboon iyo tan iyo Raamad-
misfaah, iyo Betoniim, iyo tan iyo Maxanayim iyo ilaa
soohdinta Debiir, 27 iyo kuwii dooxadii ku dhex yiil oo ahaa
Beytaaraam, iyo Beytnimraah, iyo Sukod, iyo Saafoon oo
ahaa boqorkii Xeshboon oo Siixon ahaa boqortooyadiisii
intii ka hadhay, iyo Urdun iyo soohdintiisii, iyo meesha
ugu fog badda Kinnered ee ka shishaysa Webi Urdun ee
xagga bari ka xigta. 28 Kanu waa dhaxalkii ay reer Gaad u
heleen sidii reerahoodu ahaayeen iyo magaalooyinkoodii iyo
tuulooyinkoodii. 29 Oo Muusena wuxuu dhaxal siiyey qabiilkii
reer Manaseh badhkiis. Wuxuu u ahaa qabiilkii reer Manaseh
badhkiis sidii reerahoodu ahaayeen. 30 Oo xuduudkoodu
wuxuu ka koobnaa Maxanayim, iyo Baashaan oo dhan,
iyo boqorkii Baashaan oo Coog ahaa boqortooyadiisii oo
dhan, iyo magaalooyinkii Yaa'iir oo Baashaan ku yiil oo dhan,
kuwaasoo ahaa lixdan magaalo; 31 iyo Gilecaad badhkeed,
iyo Cashtarod, iyo Edrecii, kuwaas oo ahaa magaalooyinkii
boqortooyadii Coog oo Baashaan ku yiil, waxaa la siiyey reer
Maakiir kaasoo ahaa ina Manaseh, oo waxaa loo siiyey reer
Maakiir badhkood sidii reerahoodu ahaayeen. 32 Kuwanu
waa dhaxalkii Muuse ku qaybiyey banaankii Moo'aab, oo ka
shisheeya Webi Urdun, meel u dhow Yerixoo, oo xagga bari
ka xigta. 33 Laakiinse qabiilkii reer Laawi Muuse dhaxal ma
uu siin. Waxaa dhaxal u ah Rabbiga ah Ilaaha reer binu
Israa'iil, sidii uu kula hadlay iyaga.

**14** Kuwanu waa dhaxalkii ay reer binu Israa'iil ka qaateen
dalkii reer Kancaan, oo wadaadkii Elecaasaar ahaa,
iyo Yashuuca ina Nuun, iyo madaxdii qabiilooyinkii reer
binu Israa'iil ay u qaybiyeen. 2 Oo sidii Rabbigu ku amray
Muuse sagaal qabiil iyo qabiil badhkiis saami bay ku heleen
dhaxalkoodii. 3 Waayo, Muuse wuxuu laba qabiil iyo qabiil
badhkiis dhaxal ka siiyey Webi Urdun shishadiisa: laakiinse
reer Laawi innaba dhaxal ma uu siin. 4 Maxaa yeelay,
reer Yuusuf waxay ahaayeen laba qabiil, oo kala ah reer
Manaseh iyo reer Efrayim; oo dhulkii qayb lagama siin reer
Laawi magaalooyinkii ay degganaayeen mooyaane, iyo
agagaarkoodii ay xoolahoodii iyo alaabtoodii ku hayn jireen.
5 Oo sidii Rabbigu Muuse ku amray ayay reer binu Israa'iil
yeeleen, oo dalkiina way qaybsadeen. 6 Markaasaa reer
Yahuudah waxay u soo dhowaadeen Yashuuca oo Gilgaal
joogay; oo Kaaleeb ina Yefunneh, oo ahaa reer Qenes,
wuxuu isagii ku yidhi, Waad garanaysaa wixii aniga iyo
adiga inagu saabsanaa oo Rabbigu u sheegay Muuse oo
ahaa nin Ilaah, markaynu Qaadeesh Barneeca joognay.
7 Afartan sannadood baan jiray markii addoonkii Ilaah oo
Muuse ahaa iga diray Qaadeesh Barneeca inaan dalka soo
basaaso; oo sidii qalbigayga ku jirtay ayaan ugu soo war
celiyey. 8 Habase yeeshee walaalahaygii i raacay ayaa
dadka qalbi dhalaaliyey, laakiinse anigu daacad baan u

raacay Rabbiga Ilaahayga ah. **9** Oo maalintaas ayuu Muuse
dhaartay, oo yidhi, Hubaal dhulkii cagtaadu ku joogsatay
wuxuu dhaxal u ahaan doonaa adiga iyo carruurtaada
weligiin, maxaa yeelay, daacad baad u raacday Rabbiga
Ilaahayga ah. **10** Oo haddaba bal eeg, Rabbigu waa i soo
gaadhsiiyey ilaa haatan, anoo nool, siduu ku hadlay, oo
shan iyo afartankan sannadood baa ka dambaysay markii
Rabbigu Muuse eraygan kula hadlay, oo waxay ahayd intii ay
reer binu Israa'iil cidlada dhex socdeen; oo haatanna maanta
waxaan jiraa shan iyo siddeetan sannadood. **11** Oo weliba
maanta iyo maalintii Muuse i diray isku xoog baan ahay; oo
intii itaalkaygu waagaas ahaa ayuu haatanna yahay inaan
dagaal galo, iyo inaan baxo, soona galo. **12** Haddaba sidaas
daraaddeed i sii buurtan Rabbigu maalintaas ka hadlay,
waayo, waad maqashay maalintaas in reer Canaaq halkaas
joogay, oo ay magaalooyinkoodu waaweynaayeen, deyrarna
lahaayeen. Mindhaa Rabbigaa ila jiri doona, waanan eryi
doonaa sidii Rabbigu ku hadlay. **13** Markaasaa Yashuuca u
duceeyey isagii, oo Kaaleeb ina Yefunneh dhaxal u siiyey
Xebroon. **14** Sidaas daraaddeed ilaa maantadan la joogo
Xebroon waxay dhaxal u noqotay Kaaleeb ina Yefunneh
oo ahaa reer Qenes, maxaa yeelay, daacad buu u raacay
Rabbiga ah Ilaaha reer binu Israa'iil. **15** Oo waagii hore
Xebroon magaceeda waxaa la odhan jiray Qiryad Arbac; oo
Arbacna wuxuu ahaa ninkii ugu weynaa reer Canaaq. Oo
dalkiina dagaal wuu ka xasillay.

**15** Oo reer Yahuudah qabiilkoodii waxay qayb u heleen
sidii ay reerahoodu ahaayeen ilaa soohdinta Edom, iyo
tan iyo xataa cidlada Sin ee xagga koonfureed ka xigta, iyo
xagga koonfureed ee ugu shishaysa. **2** Oo soohdintooda
koonfureedna waxay gaadhsiisnayd xagga ugu shishaysa
ee Badda Cusbada leh, iyo tan iyo gacanka koonfur u jeeda,
**3** oo waxay u baxday xagga koonfureed ee jiirta Caqrabbiim,
oo waxay u dhaaftay xagga Sin, oo haddana waxay martay
xagga koonfureed oo Qaadeesh Barneeca, oo ay martay
xagga Xesroon, oo waxay kor ugu baxday xagga Addaar, oo u
laabatay xagga Qarqaacaa; **4** oo waxay u sii dhaaftay xagga
Casmoon, oo haddana waxay u baxday xagga durdurka
Masar, oo soohdinta waxaa dhammaadkeedu ahaa badda;
taasu waxay ahaan doontaa soohdintiinna koonfureed. **5**
Oo soohdinta barina waxay ahayd ilaa Badda Cusbada
leh, iyo tan iyo meesha uu Webi Urdun ku dhammaado.
Oo waaxda woqooyi soohdinteeduna waxay ahayd badda
gacankeeda u dhow meesha uu Webi Urdun ku dhammaado;
**6** oo soohdintu waxay martay ilaa Beytxoglaah, oo waxay
sii martay xagga woqooyi oo u dhow Beytcaraabaah; oo
soohdintu waxay martay dhagaxii Bohan ina Ruubeen; **7** oo
soohdintu waxay sii martay Debiir, marka laga tago dooxadii
Caakoor, iyo xagga woqooyi ee ku soo jeedda Gilgaal, taasu
waxa weeyaan meel ku toosan jiirta Adummiim, taasoo
ku taal webiga dhiniciisa koonfureed; oo soohdintu waxay
sii martay biyaha Ceyn Shemesh, oo dhammaadkeedu
wuxuu ahaa Ceyn Rogeel agteeda; **8** oo soohdintu waxay
sii martay dooxadii ina Xinnom iyo ilaa xagga koonfureed
ee Yebuus. Taasu waa Yeruusaalem. Oo soohdintu waxay
kor ugu baxday buurta ku taal dooxadii Xinnom horteeda
ee xaggeeda galbeed, taasoo ku taal dooxada xagga
woqooyi oo ugu fog ee reer Rafaa. **9** Oo soohdintu waxay
ka soo baxday buurta dhaladeeda ilaa isha biyaha ee
Neftoo'ax, oo ay u baxday xagga magaalooyinkii ku yiil Buur
Cefroon; oo soohdintu waxay sii martay xagga Bacalaah,
(taasu waxa weeyaan Qiryad Yecaariim), **10** markaasay
soohdintu ka laabatay Bacalaah galbeedkeeda ilaa Buur
Seciir, oo waxay sii martay Buur Yecaariim dhinaceeda
woqooyi (taasuna waxa weeyaan Kesaaloon), oo waxay
hoos ugu dhaadhacday xagga Beytshemesh, oo waxay sii
martay Timneh; **11** markaasay soohdintu u baxday dhinaca
woqooyi oo Ceqroon; oo haddana soohdintu waxay u baxday
Shikeroon, oo waxay sii martay Buur Bacalaah, oo waxay u
baxday Yabne'eel agteeda; oo soohdinta dhammaadkeedu
wuxuu ahaa badda. **12** Oo soohdinta xagga galbeedna
waxay ahayd tan iyo badda weyn iyo xeebteeda. Intaasu
waa soohdintii ku soo wareegi jirtay reer Yahuudah sida
reerahoodu ahaayeen. **13** Oo wuxuu Kaaleeb ina Yefunneh
qayb ka siiyey reer Yahuudah dhexdooda, sidii Rabbigu
Yashuuca ugu amray, oo qaybtaas wuxuu ahaa Qiryad
Arbac, kaas oo ahaa Canaaq aabbihiis (taasuna waxa
weeyaan Xebroon). **14** Oo Kaaleebna halkaas wuxuu ka
eryay saddexdii wiil oo Canaaq, kuwaasoo ahaa Sheeshay,
iyo Axiiman, iyo Talmay, oo ahaa ilma Canaaq. **15** Oo
halkaasuu ka tegey oo la diriray dadkii Debiir degganaa;
oo waagii hore Debiir magaceeda waxaa la odhan jiray
Qiryad Sefer. **16** Oo Kaaleeb wuxuu yidhi, Kii Qiryad Sefer
intuu wax ku dhufta qabsada, waxaan u guurin doonaa
gabadhayda Caksaah. **17** Markaasaa magaaladii waxaa
qabsaday Cotnii'eel oo ahaa ina Qenas kii Kaaleeb walaal u
ahaa, markaasuu Caksaah u guuriyey. **18** Oo markay isagii u
timid waxay ku deddejisay inuu aabbeheed beer weyddiisto:
oo markay dameerkeedii ka soo degtay ayaa Kaaleeb ku
yidhi, Maxaad doonaysaa? **19** Kolkaasay ku tidhi, Hadiyad i
sii, waayo, waxaad i siisay dalka Koonfureed, weliba i sii ilo
biyo ah. Markaasuu siiyey ilihii sare iyo ilihii hoose. **20** Intanu
waa dhaxalkii ay reer Yahuudah heleen sidii ay reerahoodu

ahaayeen. 21 Oo qabiilkii reer Yahuudah magaalooyinkoodii
ugu fogaa xagga soohdinta koonfureed oo Edom waxay
ahaayeen Qabse'eel, iyo Ceeder, iyo Yaaguur, 22 iyo
Qiinaah, iyo Diimoonaah, iyo Cadcaadaah, 23 iyo Qedesh,
iyo Xaasoor, iyo Itnaan, 24 iyo Siif, iyo Telem, iyo Becaalood,
25 iyo Xaasoor Xadataah, iyo Qiryood Xesroon (oo taasuna
waa Xaasoor qudheeda), 26 iyo Amaam, iyo Shemac,
iyo Molaadaah, 27 iyo Xasar Gaddaah, iyo Xeshmoon,
iyo Beytfeled, 28 iyo Xasar Shuucaal, iyo Bi'ir Shebac,
iyo Bisyootiyaah, 29 iyo Bacalaah, iyo Ciyiim, iyo Cesem,
30 iyo Eltoolad, iyo Kesiil, iyo Xormaah, 31 iyo Siiqlag,
iyo Madmannaah, iyo Sansannaah, 32 iyo Lebaa'ood, iyo
Shilxiim, iyo Cayn, iyo Rimmon, oo magaalooyinka oo dhan
iyo tuulooyinkooduba waa sagaal iyo labaatan. 33 Oo dalka
dooxadana waxay ku lahaayeen Eshtaa'ool, iyo Sorcaah, iyo
Ashnaah, 34 iyo Saanoo'ax, iyo Ceyn Ganniim, iyo Tafuu'ax,
iyo Ceynaam, 35 iyo Yarmuud, iyo Cadullaam, iyo Sokoh,
iyo Caseeqaah, 36 iyo Shacarayim, iyo Cadiitayim, iyo
Gedeeraah, iyo Gedeerootayim, oo iyana waa afar iyo toban
magaalo iyo tuulooyinkoodii. 37 Iyo Senaan, iyo Xadaashaah,
iyo Migdal Gaad, 38 iyo Dilcaan, iyo Misfaah, iyo Yoqte'eel,
39 iyo Laakiish, iyo Bosqad, iyo Cegloon, 40 iyo Kabboon, iyo
Laxmaam, iyo Kitliish, 41 iyo Gedeerood, iyo Beytdagoon, iyo
Nacamaah, iyo Maqeedaah, iyana waa lix iyo toban magaalo
iyo tuulooyinkoodii. 42 Libnaah, iyo Ceter, iyo Caashaan, 43
iyo Yiftaax, iyo Ashnaah, iyo Nesiib, 44 iyo Qeciilaah, iyo
Aksiib, iyo Maareeshaah, oo iyana waa sagaal magaalo
iyo tuulooyinkoodii. 45 Ceqroon, iyo magaalooyinkeedii iyo
tuulooyinkeedii, 46 iyo Ceqroon iyo ilaa badda, iyo kulli
intii u dhowayd Ashdood iyo tuulooyinkoodii. 47 Ashdood
iyo magaalooyinkeedii iyo tuulooyinkeedii, iyo Gaasa iyo
magaalooyinkeedii, iyo tuulooyinkeedii, iyo ilaa durdurkii
Masar, iyo ilaa badda weyn, iyo soohdinteeda. 48 Iyo dalkii
buuraha lahaa oo dhan, iyo Shamiir, iyo Yatiir, iyo Sokoh, 49
iyo Dannaah, iyo Qiryad Sannaah (taasoo Debiir ah), 50
iyo Canaab, iyo Eshtemoh, iyo Caaniim, 51 iyo Goshen,
iyo Xolon, iyo Giloh, iyana waa koob iyo toban magaalo iyo
tuulooyinkoodii. 52 Araab, iyo Duumah, iyo Eshecaan, 53 iyo
Yaaniim iyo Beyd Tafuu'ax, iyo Afeeqaah, 54 Xumtaah, iyo
Qiryad Arbac (taasoo ah Xebroon), iyo Siicor, iyana waa
sagaal magaalo iyo tuulooyinkoodii. 55 Iyo Maacoon, iyo
Karmel, iyo Siif, iyo Yutaah, 56 iyo Yesreceel, iyo Yokdecaam,
iyo Saanoo'ax, 57 Kayn, iyo Gibecaah, iyo Timneh, iyana
waa toban magaalo iyo tuulooyinkoodii. 58 Xalxuul, iyo
Beytsuur, iyo Gedoor, 59 iyo Macaraad, iyo Beytcanood, iyo
Elteqon, iyana waa lix magaalo iyo tuulooyinkoodii. 60 Qiryad
Bacal (taasoo ah Qiryad Yecaariim), iyo Rabbaah, iyana waa
laba magaalo iyo tuulooyinkoodii. 61 Xagga cidladana waxay
ku lahaayeen Beytcaraabaah, iyo Middiin, iyo Sekaakaah,
62 iyo Nibshaan iyo Magaalada Cusbada leh iyo Ceyn Gedii,
iyana waa lix magaalo iyo tuulooyinkoodii. 63 Xagga reer
Yebuus, kuwaasoo Yeruusaalem degganaa, reer Yahuudah
way eryi kari waayeen; laakiinse reer Yebuus Yeruusaalem
bay la degganaayeen reer Yahuudah ilaa maantadan la
joogo.

16 Oo reer Yuusuf qaybtoodiina wuxuu ka bilaabmay
Webi Urdun oo Yerixoo ku ag yaal, biyaha Yerixoo
dhankooda bari, taasoo ah xagga cidlada, iyo markii laga
tago Yerixoo oo la dhex maro dalka buuraha leh ilaa Beytel,
2 oo wuxuu ka baxay Beytel ilaa Luus, oo wuxuu sii maray
ilaa soohdinta reer Arkii iyo ilaa Cataarood; 3 oo wuxuu
dhanka galbeed ka maray soohdinta reer Yaafleetii iyo ilaa
soohdinta Beytxooroonta hoose iyo tan iyo xataa Geser; oo
soohdinta dhammaadkeedu wuxuu ahaa xagga badda. 4
Oo reer Yuusuf, oo ahaa reer Manaseh iyo reer Efrayim,
dhaxalkoodii way qaateen. 5 Oo reer Efrayim sidii ay
reerahoodu ahaayeen soohdintoodii sidan bay ahayd; dalkii
ay dhaxalka u heleen dhinaca bari waxaa u xigay Cataarood
Addaar, iyo Beytxooroonta sare; 6 oo soohdintu waxay
galbeed ka mari jirtay Mikmetaah tan ku taal xagga woqooyi,
oo soohdintu waxay ka soo wareegtay oo bari ka martay
Ta'anad Shiloh, oo waxay bari ka martay Yaanooxaah; 7 oo
intay Yaanooxaah ka tagto ayay sii martay Cataarood, iyo
ilaa Nacaraah, oo waxay gaadhay Yerixoo, markaasay ka
sii baxday Webi Urdun. 8 Oo xagga Tafuu'axna soohdintu
waxay galbeed ka sii martay durdurka reer Qaanaah; oo
waxaa dhammaadkeedu ahaa xagga badda. Intaasu waa
dhaxalkii reer Efrayim qabiilkoodii u heleen sidii reerahoodii
ay ahaayeen, 9 iyo xataa kulli magaalooyinkii loo soocay
reer Efrayim ee ku dhex yiil dhaxalkii reer Manaseh, kuwaas
oo ahaa magaalooyinkii oo dhan iyo tuulooyinkoodii. 10 Oo
ma ay eryin reer Kancaankii degganaa Geser; laakiinse
reer Kancaan waxay dhex degganaayeen reer Efrayim ilaa
maantadan la joogo, oo waxay u noqdeen addoommo u
hawshooda.

17 Oo intanuna waxay ahayd qaybtii qabiilka reer
Manaseh, waayo, isagu wuxuu ahaa curadkii Yuusuf.
Maakiir oo ahaa curadkii Manaseh oo aabbe u ahaa
Gilecaad, wuxuu helay Gilecaad iyo Baashaan, maxaa
yeelay, isagu wuxuu ahaa dagaalyahan. 2 Oo reer Manaseh
iyo reerahoodii intii hadhay iyana qayb bay heleen; kuwaas
oo ahaa reer Abiiceser, iyo reer Xeeleq, iyo reer Asrii'eel, iyo
reer Shekem, iyo reer Heefer, iyo reer Shemiidaac; intaasu

waxay ahaayeen ilmihii labka ahaa ee Manaseh ina Yuusuf
sidii reerahoodii ahaayeen. 3 Laakiinse Seloofexaad ina
Heefer, ina Gilecaad, ina Maakiir, ina Manaseh wiilal ma
uu lahayn gabdho mooyaane, oo magacyadii gabdhihiisu
waa kuwan: Maxlaah, Nocaah, Xoglaah, Milkaah, iyo
Tirsaah. 4 Oo waxay u dhowaadeen wadaadkii la odhan
jiray Elecaasaar, iyo Yashuuca ina Nuun, iyo amiirradii, oo
waxay ku yidhaahdeen, Rabbigu wuxuu Muuse ku amray
inuu walaalahayo dhexdooda dhaxal naga siiyo. Oo sidaas
daraaddeed amarkii Rabbiga aawadiis ayuu Yashuuca
dhaxal ku siiyey walaalihii aabbahood dhexdooda. 5 Oo
reer Manaseh waxaa ku soo hagaagay toban meelood oo
aan ahayn dalkii Gilecaad iyo Baashaan oo Webi Urdun ka
shishaysa; 6 maxaa yeelay, gabdhihii Manaseh waxay dhaxal
ka dhex heleen wiilashiisii; oo dalkii Gilecaadna waxaa
lahaa wiilashii Manaseh intoodii hadhay. 7 Oo soohdintii
reer Manasehna waxay ahayd ilaa Aasheer iyo tan iyo
Mikmetaah, taasoo ku hor taal Shekem, oo soohdintu waxay
ka baxday xagga midigta, iyo ilaa dadkii degganaa Ceyn
Tafuu'ax. 8 Oo dalkii Tafuu'axna waxaa iska lahaa reer
Manaseh; laakiinse Tafuu'ax tii ku tiil soohdinta waxaa
iska lahaa reer Efrayim. 9 Oo soohdintu waxay u baxday
durdurkii Qaanaah, oo durdurka xagga koonfureed ka ahaa.
Magaalooyinkaas ku dhex yiil magaalooyinkii reer Manaseh
waxaa lahaa reer Efrayim. Soohdintii Efrayimna waxay
ahayd durdurka xaggiisa woqooyi, oo waxaa soohdintii
dhammaadkeedu ahaa badda. 10 Dhanka koonfureed
waxaa lahaa reer Efrayim, dhanka woqooyina waxaa lahaa
reer Manaseh, oo badduna waxay ahayd soohdintiisa, oo
waxay gaadheen ilaa reer Aasheer oo woqooyi jira, iyo
tan iyo reer Isaakaar oo ku yaal xagga bari. 11 Oo reer
Manaseh waxay reer Isaakaar iyo reer Aasheer ku dhex
lahaayeen Beytshe'aan, iyo magaalooyinkeedii oo dhan,
iyo Yiblecaam iyo magaalooyinkeedii, iyo dadkii degganaa
Door iyo magaalooyinkeedii, iyo dadkii degganaa Ceyn
Door iyo magaalooyinkeedii, iyo dadkii degganaa Tacanaag,
iyo magaalooyinkeedii, iyo dadkii degganaa Megiddoo
iyo magaalooyinkeedii, iyo xataa saddexdii meelood ee
dhaadheerayd. 12 Laakiin reer Manaseh ma ay eryi karin
dadkii degganaa magaalooyinkaas; reer Kancaanse waxay
doonayeen inay dalkaas sii degganaadaan. 13 Oo markii
reer binu Israa'iil aad u xoogaysteen ayay hawl saareen
reer Kancaan, oo ma ay wada eryin. 14 Oo reerkii Yuusuf
Yashuuca bay la hadleen, oo ku yidhaahdeen, Maxaad
qayb keliya dhaxal noogu siisay? Maxaa yeelay, annagu
waxaannu nahay dad badan, oo Rabbigu waa na barakeeyey
ilaa haatan. 15 Markaasaa Yashuuca wuxuu iyagii ku yidhi,
Haddaad dad badan tihiin, haddaba kaca oo duudda taga, oo
waxaad soo goosataan dalka reer Feris iyo kan reer Rafaa;
maxaa yeelay, dalka buuraha leh oo reer Efrayim waa idinku
cidhiidhi. 16 Markaasaa reerkii Yuusuf waxay yidhaahdeen,
Dalka buuraha lahu naguma filna; oo reer Kancaanka deggan
dalka dooxada leh oo dhammu waxay leeyihiin gaadhifardood
bir ah, kuwooda deggan Beytshe'aan iyo magaalooyinkeeda,
iyo kuwooda deggan dooxadii Yesreceelba. 17 Markaasaa
Yashuuca wuxuu la hadlay reer Yuusuf, kuwaasoo ahaa reer
Efrayim iyo reer Manaseh, oo wuxuu ku yidhi, Idinku waxaad
tihiin dad badan, oo waxaad leedihiin xoog badan; haddaba
qayb keliya heli maysaan; 18 laakiinse dalka buuraha leh
idinkaa yeelan doona; waayo, in kastoo uu duud yahay,
waad jari doontaan, oo meelaha laga baxona idinkaa yeelan
doona, maxaa yeelay, waxaad eryi doontaan reer Kancaan
in kastay leeyihiin gaadhifardood bir ah, oo ay xoog badan
yihiin.

18 Oo shirkii reer binu Israa'iil oo dhammu Shiiloh bay
dhammaantood isugu soo urureen, oo waxay halkaas
ka dhiseen teendhadii shirka; oo dadkii waddankana waa
laga adkaaday. 2 Oo reer binu Israa'iil dhexdooda waxaa ku
hadhay toddoba qabiil oo aan weli helin qaybtii ay dhaxalka u
lahaayeen. 3 Markaasaa Yashuuca wuxuu reer binu Israa'iil
ku yidhi, Dalkii uu Rabbiga ah Ilaaha awowayaashiin idin
siiyey ilaa goormaad ka raagaysaan inaad gashaan si aad
dalka u hantidaan? 4 Haddaba qabiil walba saddex nin
kala soo baxa; oo anigu iyaga waan diri doonaa, markaas
waa inay kacaan, oo dalka dhex maraan, oo soo kala
tilmaamaan siday u kala dhaxlayaan, oo markaas waa
inay ii yimaadaan. 5 Oo waa inay dalka u kala qaybiyaan
toddoba meelood. Reer Yahuudah waa inay degganaadaan
soohdintooda ah xagga koonfureed, oo reer Yuusufna
waa inay degganaadaan soohdintooda ah xagga woqooyi.
6 Oo waa inaad dalka u soo kala tilmaantaan toddoba
meelood, oo aad tilmaanta ii keentaan, oo markaasaan
halkan idiinku saami ridi doonaa Rabbiga Ilaaheenna ah
hortiisa. 7 Maxaa yeelay, reer Laawi dhexdiinna qayb dhaxal
ah kuma laha; waayo wadaadnimada Rabbiga ayaa dhaxal
u ah. Oo reer Gaad iyo reer Ruubeen iyo qabiilkii reer
Manaseh badhkood waxay dhaxal u qaateen meel Webi
Urdun ka shishaysa oo xagga bari ka xigta, oo Muuse oo
addoonkii Rabbiga ahaa uu iyaga siiyey. 8 Markaasaa raggii
kaceen oo tageen; oo kuwii tegey inay dalka soo tilmaamaan
Yashuuca ayaa ku amray, oo ku yidhi, Taga oo dalka dhex
mara, oo soo tilmaama, oo haddana aniga ii kaalaya, oo
markaasaan halkan Shiiloh ah idiinku saami ridi doonaa

Rabbiga hortiisa. 9 Markaasay raggii tageen oo dalkii soo
dhex mareen, oo waxay soo kala tilmaameen magaalooyinkii
oo toddoba meelood u kala qaybsan, oo waxayna ku soo
qoreen buug, oo markaasay u yimaadeen Yashuuca oo
joogay xerada Shiiloh ku taal. 10 Markaasaa Yashuuca
Shiiloh ugu saami riday iyagii Rabbiga hortiisa; oo halkaasaa
Yashuuca reer binu Israa'iil ugu qaybshay dalkii sidii ay
u kala qaybsanaayeen. 11 Oo qabiilkii reer Benyaamiin
saamigoodii ay u heleen sidii ay reerahoodii kala ahaayeen
ayaa u soo hor baxay; oo soohdintoodii ay saamiga u
heleen waxay kala dhex mari jirtay reer Yahuudah iyo reer
Yuusuf. 12 Oo soohdintoodu xagga waaxda woqooyi waxay
ka bilaabatay Webi Urdun; oo soohdintu waxay u baxday
Yerixoo dhinaceeda woqooyi, oo waxay dhex martay dalka
buuraha leh xaggiisa galbeed; oo dhammaadkeedii wuxuu u
baxay cidladii Beytaawen. 13 Oo soohdintu waxay halkaas
uga gudubtay Luus (taasoo ah Beytel), iyo ilaa dhinaceeda
koonfureed, oo soohdintu waxay ku dhaadhacday Cataarood
Addaar, taasoo u dhow buurta ku taal Beytxooroonta hoose
xaggeeda koonfureed. 14 Oo soohdintu waxay u baxday
oo ka laabatay waaxda galbeed xaggeeda koonfureed, iyo
xagga buurta ku hor taal Beytxooroon xaggeeda koonfureed;
oo soohdinta dhammaadkeedu wuxuu u baxay Qiryad Bacal
taasoo ah Qiryad Yecaariim ee ahayd magaalo ay reer
Yahuudah leeyihiin, intaasu waxay ahayd waaxdii galbeed.
15 Oo waaxdii koonfureedna waxay ka bilaabatay meesha
ugu fog Qiryad Yecaariim, oo soohdintu waxay martay
xagga galbeed, oo waxay u baxday ishii biyaha ahayd
oo Neftoo'ax; 16 oo soohdintu waxay ku dhaadhacday
meesha ugu fog buurta ku hor taal dooxadii ina Xinnom,
taasoo ku taal xagga woqooyi oo dooxada reer Rafaa,
oo waxay ku dhaadhacday ilaa dooxadii Xinnom, iyo ilaa
dhinaca reer Yebuus xaggooda koonfureed, oo waxay kaloo
sii martay Ceyn Rogeel, 17 oo waxay u leexatay xagga
woqooyi, oo waxay martay Ceyn Shemesh agteeda; oo
waxay u baxday Geliilood, taasoo ka soo hor jeedda jiirta
Adummiim; oo haddana waxay u baxday dhagaxii Bohan ina
Ruubeen; 18 oo waxay sii martay dhinaca ka soo hor jeeda
Caraabaah xaggeeda woqooyi, oo waxay ku dhaadhacday
Caraabaah; 19 oo soohdintu waxay sii martay Beytxoglaah
dhinaceeda woqooyi; oo soohdinta dhammaadkeedu wuxuu
ahaa xagga gacanka woqooyi oo Badda Cusbada leh, ee ku
yaal Webi Urdun dhammaadkiisa koonfureed meesha uu ku
dhammaado; intaasu waa soohdintii koonfureed. 20 Waaxda
bari soohdinteeduna waxay ahayd Webi Urdun. Intaasu
waxay ahayd dhaxalkii reer Benyaamiin iyo soohdimihii ku
wareegsanaa, ee ay u heleen sidii reerahoodu ahaayeen. 21
Haddaba magaalooyinkii reer Benyaamiin siday reerahoodu
ahaayeen waxay ahaayeen Yerixoo, iyo Beytxoglaah, iyo
Dooxadii Qesiis, 22 iyo Beytcaraabaah, iyo Semaarayim,
iyo Beytel, 23 iyo Cawiim, iyo Faaraah, iyo Cofraah, 24 iyo
Kefar reer Cammoon, iyo Cofnii, iyo Gebac, oo intaasu waa
laba iyo toban magaalo iyo tuulooyinkoodii, 25 iyo Gibecoon,
iyo Raamaah, iyo Bi'irod, 26 iyo Misfaah, iyo Kefiiraah, iyo
Mosaah, 27 iyo Reqem, iyo Yirfe'eel, iyo Taralaah, 28 iyo
Seelac, iyo Elef, iyo Yebuus (taasoo ah Yeruusaalem), iyo
Gibecaad, iyo Qiryad, oo intaasu waa afar iyo toban magaalo
iyo tuulooyinkoodii. Intaasu waa dhaxalkii reer Benyaamiin
siday reerahoodii ahaayeen.

19 Oo saamigii labaadna wuxuu u soo baxay reer
Simecoon, oo waa dhaxalkii ay qabiilkii reer Simecoon
u heleen siday reerahoodu ahaayeen. Oo dhaxalkooduna
wuxuu ku dhex jiray dhaxalkii reer Yahuudah. 2 Oo
waxay dhaxal u heleen: Bi'ir Shebac, ama Shebac, iyo
Molaadaah, 3 iyo Hasar Shuucaal, iyo Baalaah, iyo Cesem,
4 iyo Eltoolad, iyo Betuul, iyo Hormaah, 5 iyo Siiqlag, iyo
Beytmarkaabod, iyo Hasar Suusaah, 6 iyo Beytlebaa'ood,
iyo Shaaruuhen, oo intaasu waa saddex iyo toban magaalo
iyo tuulooyinkoodii, 7 Cayn, iyo Rimmon, iyo Ceter, iyo
Caashaan, oo intaasu waa afar magaalo iyo tuulooyinkoodii,
8 iyo tuulooyinkii ku wareegsanaa magaalooyinkaas oo
dhan ee ku yiil tan iyo Bacalad Bi'ir, iyo Raamaahda
Koonfureed. Intaasu waa dhaxalkii qabiilkii reer Simecoon
sidii ay reerahoodii ahaayeen. 9 Oo qaybtii reer Yahuudah
waxaa ku jiray dhaxalkii reer Simecoon, maxaa yeelay, reer
Yahuudah qaybtoodu waa ku badnaa; sidaas daraaddeed
reer Simecoon waxay dhaxal ka heleen dhaxalkii reer
Yahuudah dhexdiisa. 10 Oo saamigii saddexaadna wuxuu u
soo baxay reer Sebulun siday reerahoodu ahaayeen, oo
dhaxalkoodii soohdintiisuna waxay ahayd ilaa Saariid. 11 Oo
soohdintoodu waxay u baxday xagga galbeed, iyo xataa
ilaa Marcalaah, oo waxay gaadhay tan iyo Dabbaashed,
oo haddana waxay gaadhay tan iyo durdurka ku yaal
Yoqnecaam horteeda; 12 oo waxay Saariid uga leexatay
xagga bari ee qorraxdu ka soo baxdo, ilaa soohdinta Kislod
Taabor, kolkaasay waxay u baxday xagga Daberad, oo
haddana kor ugu baxday Yaafiica, 13 oo halkaasna waxay
uga gudubtay xagga bari oo martay Gad Heefer iyo tan
iyo Citaah Qaasiin, oo waxay u baxday xagga Rimmon oo
gaadhaa ilaa Neecaah, 14 soohdintu waxay xagga woqooyi
ugu laabatay Xannaatoon, oo soohdinta dhammaadkeedu
wuxuu ahaa dooxadii Yiftax'eel, 15 iyo Qataad, iyo Nahalaal,
iyo Shimroon, iyo Idalaah, iyo Beytlaxam, intaasu waa

laba iyo toban magaalo iyo tuulooyinkoodii. 16 Intaasu
waa dhaxalkii ay reer Sebulun u heleen sidii reerahoodii
ahaayeen, iyo xataa magaalooyinkan iyo tuulooyinkooduba.
17 Oo saamigii afraadna reer Isaakaar buu u soo baxay
sidii reerahoodu ahaayeen. 18 Oo soohdintooduna waxay
ahayd ilaa Yesreceel, iyo Kesullood, iyo Shuuneem, 19 iyo
Xafaarayim, iyo Shii'oon, iyo Anaaxaraad, 20 iyo Rabbiid,
iyo Qiishyoon, iyo Ebes, 21 iyo Remed, iyo Ceyn Ganniim,
iyo Ceyn Xaddaah, iyo Beytfasees, 22 oo soohdintu waxay
gaadhay ilaa Taaboor, iyo Shaxasimaah, iyo Beytshemesh,
oo soohdintooda dhammaadkeedu wuxuu ahaa xagga
Webi Urdun, oo intaasuna waa lix iyo toban magaalo iyo
tuulooyinkoodii. 23 Oo intaasu waa dhaxalkii ay qabiilkii
reer Isaakaar u heleen sidii reerahoodii ahaayeen, iyo
xataa magaalooyinkan iyo tuulooyinkooduba. 24 Oo saamigii
shanaadna wuxuu u soo baxay reer Aasheer sidii reerahoodii
ahaayeen. 25 Oo soohdintooduna waxay ahayd Xelqad,
iyo Xali, iyo Beten, iyo Akshaaf, 26 iyo Allammeleg, iyo
Camcaad, iyo Mishaal; oo wuxuu gaadhay Karmel xaggeeda
galbeed, iyo ilaa Shiihoor Libnaad, 27 oo waxay u leexatay
xagga qorraxdu ka soo baxdo, ee ah Beytdaagoon, oo waxay
gaadhay tan iyo Sebulun, iyo dooxadii Yiftax'eel xaggeeda
woqooyi iyo ilaa Beytcemeq iyo Necii'eel, oo waxay u baxday
xagga bidix ee ah Kabuul, 28 iyo Cebroon, iyo Rexob, iyo
Xammoon, iyo Qaanaah, iyo xataa Siidoonta weyn; 29 oo
soohdintii waxay u leexatay xagga Raamaah, iyo xagga
magaaladii deyrka lahayd oo Turos, oo haddana soohdintu
waxay u leexatay xagga Xosaah, oo dhammaadkeedu
wuxuu ahaa xagga badda ee Aksiib dhinaceeda ah, 30 iyo
Cummaah, iyo Afeeq, iyo Rexob, oo intaasu waa laba iyo
labaatan magaalo iyo tuulooyinkoodii. 31 Oo intaasu waa
dhaxalkii ay qabiilkii reer Aasheer u heleen sidii reerahoodii
ahaayeen, iyo xataa magaalooyinkan iyo tuulooyinkooduba
32 Oo saamigii lixaadna reer Naftaali buu u soo baxay
sidii reerahoodii ahaayeen. 33 Oo soohdintoodu waxay
ka bilaabatay Xelef, tan iyo geedka ku yaal Sacananniim,
iyo Adaamii Neqeb, iyo Yabne'eel, iyo ilaa Laquum; oo
dhammaadkeedu wuxuu ahaa xagga Webi Urdun. 34 Oo
soohdintu waxay u leexatay xagga galbeed tan iyo Asnood
Taaboor, oo halkaasna waxay ugu baxday xagga Xuqoq;
oo waxay gaadhay ilaa xagga koonfureed oo Sebulun, oo
haddana waxay gaadhay xagga galbeed oo Aasheer, iyo tan
iyo reer Yahuudah oo Webi Urdun xagga qorraxdu ka soo
baxdo ka xiga. 35 Oo magaalooyinkii deyrka lahaa waxay
ahaayeen Siddiim, iyo Seer, iyo Xammad, iyo Raqad, iyo
Kinnered, 36 iyo Adaamaah, iyo Raamaah, iyo Xaasoor,
37 iyo Qedesh, iyo Edrecii, iyo Ceyn Xaasoor, 38 iyo
Yiroon, iyo Migdal Eel, iyo Xoreem, iyo Beytcanaad iyo
Beytshemesh, waxay ahaayeen sagaal iyo toban magaalo
iyo tuulooyinkoodii. 39 Oo intaasu waa dhaxalkii ay qabiilkii
reer Naftaali u heleen sidii reerahoodii ahaayeen, iyo
xataa magaalooyinka iyo tuulooyinkooduba 40 Oo saamigii
toddobaadna wuxuu u soo baxay qabiilkii reer Daan sidii
reerahoodii ahaayeen. 41 Oo soohdintii ay dhaxalka u
heleenna waxay ahayd Sorcaah, iyo Eshtaa'ool, iyo Ciir
Shemesh, 42 iyo Shacalabbiin, iyo Ayaaloon, iyo Yitlaah, 43
iyo Eeloon, iyo Timnaataah, iyo Ceqroon, 44 iyo Elteqeeh,
iyo Gibbetoon, iyo Bacalad, 45 iyo Yehud, iyo Bini Beraaq,
iyo Gad Rimmoon, 46 iyo Meey Yarqoon, iyo Raqoon, iyo
soohdinta ka soo hor jeedda Yaafaa. 47 Oo soohdintii reer
Daan iyagay ka baxday, oo intay reer Daan tageen ayay la
dirireen Leshem, oo way qabsadeen, oo dadkii degganaana
waxay ku laayeen seef markaasay Leshem hantiyeen oo
iska degeen, oo waxay u bixiyeen Daan, kaas oo ahaa
magicii awowgood Daan. 48 Oo intaasu waa dhaxalkii ay
qabiilkii reer Daan u heleen sidii reerahoodii ahaayeen, iyo
xataa magaalooyinkan iyo tuulooyinkooduba. 49 Sidaasay ku
dhammeeyeen qaybintii dhulkii ay dhaxalka u qaybsanayeen
siday soohdimihiisu ahaayeen, oo reer binu Israa'iil dhaxal
bay Yashuuca ina Nuun dhexdooda ka siiyeen, 50 oo
sidii Rabbigu ku amray waxay isagii siiyeen magaaladii uu
weyddiistay taasoo ahayd Timnad Serah oo ku tiil dalka
buuraha leh oo reer Efrayim; markaasuu magaaladii dhistay
oo dhex degay. 51 Kuwanu waa qaybihii dhaxalka ahaa ee
wadaadkii Elecaasaar ahaa, iyo Yashuuca ina Nuun, iyo
madaxdii reer binu Israa'iil qabiilooyinkoodii, ay saamiga ugu
qaybiyeen Rabbiga hortiisa, iyagoo jooga Shiiloh, oo fadhiya
teendhadii shirka iriddeeda. Wayna dhammeeyeen qaybintii
dhulka.

20 Markaasaa Rabbigu Yashuuca la hadlay, oo ku yidhi,
2 La hadal reer binu Israa'iil, oo waxaad ku tidhaahdaa,
Sooca magaalooyinkii magangalka oo aan idiinku sheegay
Muuse, 3 in gacankudhiiglihii qof dilaa, isagoo aan u kasayn
oo aan badheedh u samayn, uu halkaas u cararo; oo waxay
idiin noqonayaan meeshaad ka magangeli lahaydeen kan
dhiigga ka aarsada. 4 Oo magaalooyinkaas middood waa
inuu u cararaa, oo waa inuu istaagaa iridda magaalada laga
soo galo, oo xaalkiisa waa inuu u caddeeyaa odayaasha
magaalada, oo iyana waa inay magaalada soo geliyaan,
oo meel siiyaan inuu la degganaado. 5 Oo haddii kan
dhiigga ka aarsadaa uu soo eryado, markaas waa inaanay
gacankudhiiglihii gacantiisa gelin, maxaa yeelay, kaasu
wuxuu deriskiisa ku dilay kama' oo horena ma uu nebcaan

jirin. 6 Oo magaaladaas waa inuu degganaadaa ilaa uu xukun
isu hor taago shirka, iyo ilaa uu ka dhinto wadaadka sare oo
jiri doona waayahaas, oo markaas ka dib gacankudhiigluhu
waa inuu noqdaa, oo waa inuu magaaladiisii yimaadaa,
iyo gurigiisii, ilaa magaaladii uu markii hore ka cararay. 7
Oo waxay sooceen Qedesh oo ku tiil Galili oo ah dalka
buuraha leh oo reer Naftaali, iyo Shekem oo iyana ku tiil
dalka buuraha leh oo reer Efrayim, iyo Qiryad Arbac (oo ah
Xebroon) ee ku tiil dalka buuraha leh oo reer Yahuudah. 8
Oo Webi Urdun shishadiisa meel Yerixoo u dhow oo bari
ka xigta waxay ka sooceen Beser oo ku tiil cidladii ku tiil
bannaankii qabiilka reer Ruubeen, iyo Raamod oo ku tiil
Gilecaad oo ay qabiilkii reer Gaad lahaayeen, iyo Goolaan
oo ku tiil Baashaan oo ay qabiilkii reer Manaseh lahaayeen.
9 Intaasu waa magaalooyinkii loo doortay reer binu Israa'iil
oo dhan, iyo qariibkii dhexdooda degganaa, in ku alla kii
qof dilaa, isagoo aan u kasayn, uu halkaas ku carari karo
inaanu ku dhiman gacanta kan dhiigga ka aarsada, ilaa uu
hor istaago shirka.

**21** Markaasaa madaxdii reer Laawi waxay u soo
dhowaadeen wadaadkii Elecaasaar ahaa, iyo Yashuuca
ina Nuun, iyo madaxdii reer binu Israa'iil qabiilooyinkoodii. 2
Wayna kula hadleen, iyagoo jooga Shiiloh oo ku taal dalkii
reer Kancaan, oo waxay ku yidhaahdeen, Rabbigu wuxuu
noogu amray Muuse in nala siiyo magaalooyin aan degno
iyo agagaarkoodii ay xoolahayagu daaqaan. 3 Markaasaa
reer binu Israa'iil waxay dhaxalkoodii reer Laawi ka siiyeen
magaalooyinkaas iyo agagaarkooda sidii amarka Rabbigu
ahaa. 4 Markaasaa saami u soo baxay qolooyinkii reer
Qohaad; oo reerkii wadaadkii Haaruun ahaa, kuwaasoo reer
Laawi ka mid ahaa, waxay saami kaga heleen reer Yahuudah
iyo reer Simecoon, iyo reer Benyaamiin saddex iyo toban
magaalo. 5 Oo reer Qohaad intoodii hadhay waxay saami
kaga heleen qolooyinkii reer Efrayim, iyo reer Daan, iyo reer
Manaseh badhkood toban magaalo. 6 Oo reer Gershoonna
waxay saami kaga heleen qolooyinkii reer Isaakaar, iyo reer
Aasheer, iyo reer Naftaali, iyo reer Manaseh badhkoodii
degganaa Baashaan saddex iyo toban magaalo. 7 Oo reer
Meraariina sidii ay reerahoodii ahaayeen waxay ka heleen
reer Ruubeen, iyo reer Gaad, iyo reer Sebulun laba iyo
toban magaalo. 8 Oo reer binu Israa'iil magaalooyinkaas iyo
agagaarkoodiiba waxay saami ku siiyeen reer Laawi sidii
Rabbigu ku amray Muuse. 9 Oo waxaa laga siiyey qabiilkii
reer Yahuudah iyo qabiilkii reer Simecoon magaalooyinkan
magacooda halkan lagu sheegayo. 10 Oo waxaa iska lahaa
reerkii Haaruun ee ahaa qolooyinkii reer Qohaad, kuwaasoo
ka mid ahaa reer Laawi; maxaa yeelay, iyagaa saamiga
hore lahaa. 11 Oo waxaa la siiyey Qiryad Arbac, oo Arbacna
wuxuu ahaa Canaaq aabbihiis (oo taasuna waa Xebroon),
oo waxay ku tiil dalka buuraha leh ee reer Yahuudah, iyada
iyo agagaarkeeda ku wareegsanba. 12 Laakiinse magaalada
beeraheedii iyo tuulooyinkeediiba waxay siiyeen Kaaleeb ina
Yefunneh inuu hanti ahaan u qaato. 13 Oo wadaadkii Haaruun
ahaa reerkiisii waxay siiyeen Xebroon iyo agagaarkeedii,
oo taasu waxay ahayd magaaladii magangalka u ahayd
gacankudhiiglaha, iyo Libnaah iyo agagaarkeedii, 14 iyo
Yatiir iyo agagaarkeedii, iyo Eshtemooca iyo agagaarkeedii,
15 iyo Xolon iyo agagaarkeedii, iyo Debiir iyo agagaarkeedii,
16 iyo Cayn iyo agagaarkeedii, iyo Yutaah iyo agagaarkeedii,
iyo Beytshemesh iyo agagaarkeedii, oo labadaas qabiil
waxay ka heleen sagaal magaalo. 17 Oo qabiilkii reer
Benyaamiinna waxay ka heleen Gibecoon iyo agagaarkeedii,
iyo Geeraa iyo agagaarkeedii, 18 iyo Canaatood iyo
agagaarkeedii, intaasu waxay ahayd afar magaalo. 19 Oo
wadaadkii Haaruun ahaa reerkiisii magaalooyinkoodii oo
dhammu waxay ahaayeen saddex iyo toban magaalo iyo
agagaarkoodii. 20 Oo qolooyinkii reer Qohaad oo ahaa
reer Laawi, xataa reer Qohaad intoodii hadhay, waxay
magaalooyin saami uga heleen qabiilkii reer Efrayim. 21 Oo
waxay iyagii siiyeen Shekem iyo agagaarkeedii, oo waxay
ku tiil dalka reer Efrayim oo buuraha leh, oo waxayna ahayd
magaaladii magangalka u ahayd gacankudhiiglaha, iyo
Geser iyo agagaarkeedii, 22 iyo Qibsayim iyo agagaarkeedii,
iyo Beytxooroon iyo agagaarkeedii, oo intaasu waxay
ahayd afar magaalo. 23 Oo qabiilkii reer Daanna waxay
ka heleen Elteqaah iyo agagaarkeedii, iyo Gibbetoon iyo
agagaarkeedii, 24 iyo Ayaaloon iyo agagaarkeedii, iyo Gad
Rimmoon iyo agagaarkeedii, oo intaasu waxay ahayd afar
magaalo. 25 Oo qabiilkii reer Manaseh badhkiisna waxay ka
heleen Tacanaag iyo agagaarkeedii, iyo Gad Rimmoon iyo
agagaarkeedii, oo intaasu waxay ahayd laba magaalo. 26 Oo
qolooyinkii reer Qohaad intoodii hadhay magaalooyinkoodii
oo dhammu waxay ahaayeen toban iyo agagaarkoodii.
27 Oo reer Gershoon oo ahaa reer Laawi waxaa qabiilkii
reer Manaseh badhkiis laga siiyey Goolaan, oo Baashaan
ku dhex taal iyo agagaarkeedii, oo taasu waxay ahayd
magaaladii magangalka u ahayd gacankudhiiglaha, iyo
weliba Beceshteraah iyo agagaarkeedii, oo intaasu waxay
ahayd laba magaalo. 28 Oo waxay qabiilkii reer Isaakaarna
ka heleen Qiishyoon iyo agagaarkeedii, iyo Daaberad iyo
agagaarkeedii, 29 iyo Yarmuud iyo agagaarkeedii, iyo Ceyn
Ganniim iyo agagaarkeedii, oo intaasu waxay ahayd afar
magaalo. 30 Oo waxay qabiilkii reer Aasheerna ka heleen

Mishaal iyo agagaarkeedii, iyo Cabdoon iyo agagaarkeedii,
31 iyo Xelqad iyo agagaarkeedii, iyo Rexob iyo agagaarkeedii,
oo intaasu waxay ahayd afar magaalo. 32 Oo waxay
qabiilkii reer Naftaalina ka heleen Qedesh oo ku taal
Galili iyo agagaarkeedii, oo taasu waxay ahayd magaaladii
magangalka u ahayd gacankudhiiglaha, iyo Xammod Door
iyo agagaarkeedii, iyo Qartaan iyo agagaarkeedii, oo intaasu
waxay ahayd saddex magaalo. 33 Oo magaalooyinkii reer
Gershoon oo dhan, sidii qolooyinkoodu ahaayeen, saddex
iyo toban magaalo iyo agagaarkoodii bay ahaayeen. 34
Oo qolooyinkii reer Meraarii oo ahaa intii ka hadhay reer
Laawi waxay qabiilkii reer Sebulun ka heleen Yoqnecaam iyo
agagaarkeedii, iyo Qartaah iyo agagaarkeedii, 35 iyo Dimnaah
iyo agagaarkeedii, iyo Nahalaal iyo agagaarkeedii, oo intaasu
waxay ahayd afar magaalo. 36 Oo waxay qabiilkii reer
Ruubeenna ka heleen Beser iyo agagaarkeedii, iyo Yahas
iyo agagaarkeedii, 37 iyo Qedemood iyo agagaarkeedii,
iyo Mefacad iyo agagaarkeedii, oo intaasu waxay ahayd
afar magaalo. 38 Oo waxay qabiilkii reer Gaadna ka heleen
Raamod oo ku dhex taal Gilecaad iyo agagaarkeedii,
oo taasu waxay ahayd magaaladii magangalka u ahayd
gacankudhiiglaha, iyo Maxanayim iyo agagaarkeedii, 39 iyo
Xeshboon iyo agagaarkeedii, iyo Yaser iyo agagaarkeedii, oo
intaasu dhammaantood waxay ahaayeen afar magaalo. 40
Oo kulli intaas oo dhammu waxay ahaayeen magaalooyinkii
qolooyinkii reer Meraarii iyo xataa reer Laawi intoodii hadhay,
oo qaybtoodii waxay ahayd laba iyo toban magaalo. 41
Oo reer Laawi magaalooyinkoodii ay qaybta u heleen
ee ku dhex yiil dalkii hantida u ahaa reer binu Israa'iil
kulligood waxay ahaayeen siddeed iyo afartan magaalo
iyo agagaarkoodii. 42 Magaalooyinkaas mid waluba waxay
lahayd agagaarkeedii ku wareegsanaa; oo magaalooyinku
dhammaantood sidaasay ahaayeen. 43 Sidaasuu Rabbigu
reer binu Israa'iil u siiyey dhulkii u awowayaashood ugu
dhaartay inuu siiyo oo dhan, oo iyana way hantiyeen,
wayna iska degeen. 44 Oo Rabbigu wuxuu iyagii ka nasiyey
dadkii ku wareegsanaa, siduu awowayaashood ugu dhaartay
oo dhan: oo nin cadaawayaashoodii oo dhan ka mid ihi
hortooda isma taagin, oo Rabbigu cadaawayaashoodii oo
dhan gacantuu u soo geliyey. 45 Oo waxba kama baaqan
innaba wixii wanaagsanaa oo Rabbigu u sheegay reer binu
Israa'iil; laakiinse kulli way wada ahaadeen.

**22** Markaasaa Yashuuca u yeedhay reer Ruubeen, iyo reer
Gaad, iyo reer Manaseh badhkiis, 2 oo wuxuu ku yidhi,
Waad xajiseen kulli wixii uu addoonkii Rabbiga oo Muuse
ahaa idinku amray, oo codkaygana waad dhegaysateen
oo waad yeesheen kulli wixii aan idinku amray. 3 Oo
waagaas ilaa maantadan la joogo walaalihiin kama aydnaan
tegin, laakiinse waad xajiseen amarkii Rabbiga Ilaahiinna
ah. 4 Oo haatan Rabbiga Ilaahiinna ahu walaalihiin buu
nasiyey, siduu markii hore kula hadlay; haddaba noqda,
oo taga teendhooyinkiinnii, iyo dalkii hantida idiin ahaa,
oo addoonkii Rabbiga oo Muuse ahaa idinka siiyey Webi
Urdun shishadiisa. 5 Laakiinse aad iyo aad u dadaala inaad
yeeshaan amarkii iyo sharcigii uu addoonkii Rabbiga ee
Muuse ahaa idinku amray, kuwaasoo ah inaad Rabbiga
Ilaahiinna ah jeclaataan, oo aad ku socotaan jidadkiisa oo
dhan, oo aad amarradiisa xajisaan, oo aad isaga aad u
sii xajisataan, oo aad qalbigiinna oo dhan iyo naftiinna oo
dhan ugu adeegtaan. 6 Markaasuu Yashuuca u duceeyey
oo iska diray, oo iyana waxay tageen teendhooyinkoodii. 7
Oo reer Manaseh badhkiis Muuse wuxuu dhaxal ka siiyey
Baashaan dhexdeeda; laakiinse badhkii kale Yashuuca ayaa
dal ka siiyey walaalahood dhexdooda meel Webi Urdun ka
shishaysa oo xagga galbeed ka xigta. Oo weliba Yashuuca
markuu iyagii iska diray, oo ay teendhooyinkoodii tageen,
ayuu u duceeyey iyaga, 8 oo intuu la hadlay ayuu ku yidhi,
Teendhooyinkiinnii kula noqda maal badan, iyo lo' aad u tiro
badan, iyo lacag, iyo dahab, iyo naxaas, iyo bir, iyo dhar
aad u badan; oo boolidii cadaawayaashiinna laga helay
walaalihiin la qaybsada. 9 Markaasaa reer Ruubeen, iyo
reer Gaad, iyo reer Manaseh badhkiis ayaa noqday, oo ka
tegey reer binu Israa'iil oo joogay Shiiloh taasoo ku taal dalkii
Kancaan, inay u kacaan dalkii Gilecaad, kaasoo ahaa dalkii
hantidooda ahaa, ee ay ku hantiyeen amarkii Rabbigu Muuse
u soo dhiibay. 10 Oo markay yimaadeen gobolkii u dhowaa
Webi Urdun oo ku yaalay dalkii Kancaan ayay reer Ruubeen,
iyo reer Gaad, iyo reer Manaseh badhkiis Webi Urdun agtiisa
ka dhiseen meel allabari oo muuq weyn. 11 Markaasaa reer
binu Israa'iil waxay maqleen in la yidhi, Reer Ruubeen, iyo
reer Gaad, iyo reer Manaseh badhkiis ayaa meel allabari ka
dhisay darafka dalka Kancaan, meeshaas oo ah gobolka u
dhow Webi Urdun oo ah dinaca ay leeyihiin reer binu Israa'iil.
12 Oo markii reer binu Israa'iil ay taas maqleen ayaa shirkii
reer binu Israa'iil oo dhammu ku ururay Shiiloh inay dagaal
ugu baxaan iyaga. 13 Oo reer binu Israa'iil waxay xagga
reer Ruubeen, iyo reer Gaad, iyo reer Manaseh badhkiis oo
joogay dalkii Gilecaad u direen Fiinexaas oo ahaa wiilkii
wadaadkii ahaa Elecaasaar. 14 Oo waxay isagii ku dareen
toban amiir, oo amiirba wuxuu ka socday qabiilooyinka
reer binu Israa'iil midkood, oo mid waluba wuxuu ahaa
kii madaxda u ahaa reerahooda ku jira kumanyaalka reer
binu Israa'iil. 15 Markaasay u yimaadeen reer Ruubeen,
iyo reer Gaad, iyo reer Manaseh badhkiis oo joogay dalkii

Gilecaad, oo intay la hadleen ayay ku yidhaahdeen, 16
Shirkii Rabbiga oo dhammu sidan bay leeyihiin, Waa maxay
xadgudubkan aad ku samayseen Ilaaha reer binu Israa'iil,
idinkoo ka leexday inaad Rabbiga la socotaan, oo meel
allabari dhistay, si aad maanta Rabbiga ugu caasiyowdaan?
17 Miyuu nagu yar yahay dembigii Fecoor oo aannan iska
nadiifin ilaa maantadan la joogo in kastoo ay belaayo ku
soo degtay shirka Rabbiga, 18 inaad maanta ka leexataan
inaad Rabbiga la socotaan? Oo caasinimadii aad maanta
Rabbiga ku caasiyowdeen aawadeed ayuu berrito ugu
cadhoon doonaa shirka reer binu Israa'iil oo dhan. 19 Habase
yeeshee, haddii dalkii hantidiinna ahaa aanu nadiif ahayn,
de markaas u soo gudba dalka Rabbiga hantidiisa ah, oo
uu taambuuggii Rabbigu ku dhex jiro, oo nala qayb qaata;
laakiinse Rabbiga ha ku caasiyoobina, oo annagana ha nagu
caasiyoobina, oo ha dhisina meel allabari oo aan ahayn tii
Rabbiga Ilaaheenna ah. 20 Caakaan ina Serax miyaanu ku
xadgudbin alaabtii la nidray, oo taas daraaddeed miyaan
cadho ugu dhicin shirkii reer binu Israa'iil oo dhan? Oo
ninkaasu keligiis kuma uu dhiman dembigiisii. 21 Markaasaa
reer Ruubeen iyo reer Gaad iyo reer Manaseh badhkiis
waxay u jawaabeen oo la hadleen kuwii madaxda u ahaa
kumanyaalka reer binu Israa'iil, oo ku yidhaahdeen, 22
Rabbiga ah Ilaaha ilaahyada, Rabbiga ah Ilaaha ilaahyadu
wuu og yahay, oo reer binu Israa'iilna waa inuu ogaadaa,
haddii taasu caasinimo tahay, ama xadgudub Rabbiga ka
gees ah (maanta ha na badbaadin), 23 iyo haddii aan meel
allabari u dhisannay inaannu Rabbiga kaga leexanno, ama
haddii aannu u dhisnay in lagu dul bixiyo qurbaan la gubo,
ama qurbaan hadhuudh ah, ama in lagu dul bixiyo allabari
ah qurbaanno nabaadiino, sidaas hadday tahay, Rabbiga
qudhiisu ha na weyddiiyo; 24 oo haddii aannan taas u
samaynin feejignaan iyo sabab aawadood, annagoo leh, Waa
dambe carruurtiinnu waxay la hadli doonaan carruurtayada,
oo waxay ku odhan doonaan, Maxaa idinka galay Rabbiga
Ilaaha u ah reer binu Israa'iil? 25 Waayo, Rabbigu wuxuu
Webi Urdun ka dhigay soohdin inoo dhexaysa annaga
iyo idinka, reer Ruubeen iyo reer Gaadow. Qayb kuma
lihidin Rabbiga. Oo sidaasay carruurtiinnu carruurtayada uga
joojin doonaan cabsida Rabbiga. 26 Oo sidaas daraaddeed
waxaannu isnidhi, Haddaba aynu isu diyaarinno inaynu
dhisanno meel allabari, oo aan lagu bixin qurbaan la gubo
ama allabari, 27 laakiinse waxay noqon doontaa markhaati
inoo dhexeeya annaga iyo idinka, iyo farcankeenna inaga
dambeeya, si aannu Rabbiga hortiisa ugu adeegno annagoo
wadna qurbaannadayada la gubo, iyo allabaryadayada, iyo
qurbaannadayada nabaadiinada, inaan carruurtiinnu waa
dambe ku odhan carruurtayada, Qayb kuma lihidin Rabbiga.
28 Sidaas daraaddeed waxaannu isnidhi, Markay sidaas
waa dambe inagu yidhaahdaan innaga ama farcankeenna,
waxay noqon doontaa oo aannu ku odhan doonnaa, Bal
eega, hannaankii meeshii allabariga oo Rabbiga, ee ay
awowayaasheen dhiseen oo aan lagu bixin qurbaanno la
gubo ama allabari, laakiinse waa markhaati inoo dhexeeya
annaga iyo idinka. 29 Ilaah ha naga fogeeyo inaannu
Rabbiga ku caasiyowno, oo aannu ka leexanno lasocodkii
Rabbiga, oo aannu meel allabari u dhisno qurbaan la
gubo, iyo qurbaan hadhuudh ah, ama allabari, taasoo aan
ahayn meeshii allabariga Rabbiga Ilaaheen ah ee ku hor
taal taambuuggiisa. 30 Oo wadaadkii Fiinexaas ahaa iyo
amiirradii shirka, oo ahaa madaxdii kumanyaalka reer binu
Israa'iil oo isaga la socday, kolkay maqleen warkii ay reer
Ruubeen, iyo reer Gaad, iyo reer Manaseh badhkiis ku
hadleen ayay aad ugu farxeen. 31 Markaasaa wadaadkii
ahaa Fiinexaas ina Elecaasaar wuxuu ku yidhi reer Ruubeen
iyo reer Gaad iyo reer Manaseh, Maanta waannu og nahay in
Rabbigu ina dhex joogo, maxaa yeelay, idinku xadgudubkan
kuma aydnaan samayn Rabbiga. Haddaba idinku waxaad
reer binu Israa'iil ka samatabbixiseen gacantii Rabbiga. 32
Markaasaa wadaadkii ahaa Fiinexaas ina Elecaasaar, iyo
amiirradii waxay ka noqdeen reer Ruubeen iyo reer Gaad oo
joogay dalkii Gilecaad, oo waxay tageen dalkii reer Kancaan,
oo reer binu Israa'iil ayay warkii u sheegeen. 33 Oo reer binu
Israa'iilna waa ku farxeen warkaas. Markaasaa reer binu
Israa'iil Ilaah ammaaneen, oo mar dambena kuma ay hadlin
inay dagaal ugu kacaan, oo ay baabbi'iyaan dalka ay reer
Ruubeen iyo reer Gaad deggan yihiin. 34 Markaasaa reer
Ruubeen iyo reer Gaad waxay meeshii allabariga u bixiyeen
Markhaati; waayo, waxay yidhaahdeen, Waa markhaati na
dhex yaal in Rabbigu Ilaah yahay.

**23** Maalmo badan dabadood, markii Rabbigu reer
binu Israa'iil ka nasiyey cadaawayaashoodii ku
wareegsanaa, Yashuucana da' weynaa, gabowna la dhacay,
2 ayaa Yashuuca u yeedhay reer binu Israa'iil oo dhan, iyo
waayeelladoodii, iyo madaxdoodii, iyo xaakinnadoodii, iyo
saraakiishoodii, oo wuxuu ku yidhi, Anigu waan da' weynahay
oo gabow baan la dhacay; 3 oo idinkuna waad aragteen kulli
wixii Rabbigu quruumahan oo dhan ku sameeyey idinka
aawadiin; waayo, kan idiin diriray waa Rabbiga Ilaahiinna ah.
4 Bal eega waan idiin qaybiyey quruumahan hadhay inay
qabiilooyinkiinna dhaxal u ahaadaan, tan iyo Webi Urdun iyo
kulli quruumihii aan gooyay, iyo xataa tan iyo xagga gabbalku
u dhaco ee badda weyn. 5 Oo Rabbiga Ilaahiinna ahu

iyaga hortiinnuu ka tuuri doonaa, oo idinka hor eryi doonaa,
oo markaasaad dalkooda hantiyi doontaan, sidii Rabbiga
Ilaahiinna ahu idinkula hadlay. 6 Sidaas daraaddeed aad
u dhiirranaada inaad xajisaan oo yeeshaan kulli waxa ku
qoran kitaabkii sharcigii Muuse, iyo inaydnaan sharcigaas
uga leexan xagga midigta iyo xagga bidixda toona. 7 Oo
iska jira inaydnaan quruumahaas dhex iman, kuwaasoo ah
kuwa idinku dhex hadhay, oo magacyada ilaahyadoodana
marnaba ha soo hadalqaadina, ninnana ha ku dhaaranina,
hana u adeegina, hana u sujuudina kolnaba, 8 laakiin
Rabbiga Ilaahiinna ah aad u sii xajista sidaad ilaa maantadan
la joogo yeesheen. 9 Waayo, Rabbigu wuxuu hortiinna ka
eryay quruumo waaweyn oo xoog badan; oo weliba idinka
ninna idinma hor istaagin ilaa maantadan la joogo. 10 Nin
keliya oo idinka mid ahu kun buu eryi doonaa; waayo, kan
idiin diriraa waa Rabbiga Ilaahiinna ah siduu idinkula hadlay.
11 Haddaba isjira oo jeclaada Rabbiga Ilaahiinna ah. 12
Haddaadse dib ugu noqotaan oo aad u xajisataan kuwa
ka hadhay quruumahan, kuwaas oo ah kuwa idinku dhex
hadhay, haddaad guursataan oo aad isdhex gashaan, oo
iyana ay idin dhex galaan, 13 markaas xaqiiq ahaan u ogaada
inuusan Rabbiga Ilaahiinna ahu mar dambe quruumahaas
hortiinna ka eryayn, laakiinse waxay idinku noqon doonaan
siriq iyo dabin, oo markaasay dhinacyada idinka karbaashi
doonaan, oo indhahana qodxan idinkaga mudi doonaan,
ilaa aad ka baabba'daan dalkan wanaagsan oo Rabbiga
Ilaahiinna ahu idin siiyey. 14 Bal eega, maanta waxaan
mari doonaa jidka dadka dhulka jooga oo dhan; idinkuna
waad ku og tihiin qalbigiinna oo dhan iyo naftiinna oo dhan,
inaan wax keliyuhu ka baaqan kulli wixii wanaagsanaa oo
Rabbiga Ilaahiinna ahu xaggiinna kaga hadlay; laakiinse
kulligood way idiin wada ahaadeen oo mid keliyuhu kama
baaqan. 15 Oo siday waxyaalihii wanaagsanaa idiinku soo
wada degeen, kuwaasoo ahaa kuwii Rabbiga Ilaahiinna
ahu idinkula hadlay, ayaa Rabbigu idiinku soo dejin doonaa
waxyaalaha sharka ah oo dhan, ilaa uu idinka baabbi'iyo
dalkan wanaagsan oo Rabbiga Ilaahiinna ahu idin siiyey.
16 Markaad ku xadgudubtaan axdigii Rabbiga Ilaahiinna
ahu idinku amray, oo aad ka tagtaan, ee aad u adeegtaan
ilaahyo kale, oo aad iyaga u sujuuddaan, de markaasaa
cadhada Rabbigu idinku kululaan doontaa, oo aad haddiiba
ka baabbi'i doontaan dalka wanaagsan oo uu idin siiyey.

24 Markaasaa Yashuuca qabiilooyinkii reer binu Israa'iil
oo dhan ku soo urursHay Shekem, oo wuxuu u
yeedhay waayeelladii reer binu Israa'iil, iyo madaxdoodii, iyo
xaakinnadoodii, iyo saraakiishoodii, oo waxay kulligood ku
soo urureen Ilaah hortiisa. 2 Oo Yashuuca wuxuu dadkii oo
dhan ku yidhi, Rabbiga ah Ilaaha reer binu Israa'iil wuxuu
leeyahay, Awowayaashiin waxay waa hore degganaan
jireen Webigii shishadiisa, oo waxaa ka mid ahaa Terax
oo ahaa aabbihii Ibraahim iyo Naaxoor; waxayna u adeegi
jireen ilaahyo kale. 3 Markaasaan awowgiin Ibraahim ka
soo kexeeyey Webiga shishadiisa, oo aan dhex mariyey
dalka Kancaan oo dhan, oo farcankiisiina waan badiyey, oo
waxaan siiyey Isxaaq. 4 Isxaaqna waxaan siiyey Yacquub iyo
Ceesaw; Ceesawna waxaan Buur Seciir u siiyey inuu hantiyo,
oo Yacquub iyo carruurtiisiina waxay ku dhaadhaceen
xagga dalka Masar. 5 Oo markaasaan soo diray Muuse
iyo Haaruun, oo Masarna belaayaan ku riday, sidii wixii
aan dhexdooda ku sameeyey; oo dabadeedna waan idinka
soo saaray. 6 Oo awowayaashiin waxaan ka soo saaray
Masar, oo markaasaad timaadeen badda; oo Masriyiintiina
awowayaashiin ayay ku sii eryadeen gaadhifardood, iyo
fardooley, ilaa ay yimaadeen Badda Cas. 7 Oo markay
Rabbiga u qayshadeen ayuu gudcur kala dhex dhigay idinka
iyo Masriyiintii, oo badduu ku soo daayay oo ku daboolay;
oo indhihiinnaad ku aragteen wixii aan ku sameeyey Masar;
oo idinna maalmo badan ayaad cidlada degganaydeen. 8
Oo markaasaan idin keenay dalkii reer Amor, kuwaasoo
degganaa Webi Urdun shishadiisa, oo iyana way idinla
dirireen; kolkaasaan gacanta idiin geliyey, oo dalkoodiina
waad hantideen, iyagiina hortiinna waan ka baabbi'iyey.
9 Dabadeedna waxaa kacay boqorkii Moo'aab oo ahaa
Baalaaq ina Sifoor, oo wuxuu la diriray reer binu Israa'iil,
markaasuu u yeedhay oo idiinku soo diray inuu idin habaaro
Balcaam ina Becoor. 10 Laakiinse anigu Balcaam ma aanan
dhegaysan; sidaas daraaddeed weliba wuu idiin sii duceeyey;
oo sidaasaan gacantiisii idiinka samatabbixiyey. 11 Oo idinku
waxaad ka soo gudubteen Webi Urdun oo aad timaadeen
Yerixoo, oo dadkii reer Yerixoo way idinla dagaallameen,
kuwaasu waxay ahaayeen reer Amor, iyo reer Feris, iyo reer
Kancaan, iyo reer Xeed, iyo reer Girgaash, iyo reer Xiwi,
iyo reer Yebuus, oo anna dhammaantood gacantaan idiin
geliyey. 12 Oo waxaan idinka hor mariyey xoonkii hortiinna
ka eryay iyagii oo ahaa xataa labadii boqor oo reer Amor,
oo kuwaas kuma aadan eryin seeftaada iyo qaansadaada
toona. 13 Oo waxaan idin siiyey dal aydnaan u hawshoon, iyo
magaalooyin aydnaan dhisan, oo waad iska dhex degtaan,
oo waxaad ka cuntaan canab iyo saytuun aydnaan beeran.
14 Haddaba Rabbiga ka cabsada, oo daacad iyo run ugu
adeega; oo iska fogeeya ilaahyadii awowayaashiin ugu
adeegi jireen Webiga shishadiisa, iyo dalka Masar dhexdiisa,
oo idinku waxaad u adeegtaan Rabbiga. 15 Oo hadday shar
idinla tahay inaad Rabbiga u adeegtaan, haddaba maanta

doorta kii aad u adeegi doontaan, ama ha noqoto ilaahyadii
awowayaashiin ugu adeegi jireen Webiga shishadiisa, ama
ilaahyada reer Amor, kuwaas oo aad dalkoodii deggan tihiin;
laakiinse aniga iyo reerkayguba waxaannu u adeegi doonaa
Rabbiga. 16 Kolkaasaa dadkii waxay ugu jawaabeen, Ilaah
ha naga fogeeyo inaannu Rabbiga ka tagno oo aannu u
adeegno ilaahyo kale; 17 waayo, Rabbiga Ilaaheenna ahu
waa kii innaga iyo awowayaasheenba inaga soo saaray
dalkii Masar oo ahaa gurigii addoonsiga, oo isagu waa
kii calaamooyinkaas waaweyn ku sameeyey horteenna
oo inagu dhawrayay jidkii aan soo marnay oo dhan, oo
inaga samatabbixiyey dadkii aynu soo dhex soconnay oo
dhan. 18 Oo Rabbigu wuxuu horteenna ka eryay dadkii
oo dhan, iyo xataa reer Amor oo dalka degganaa; oo
sidaas daraaddeed annaguna waxaannu u adeegi doonnaa
Rabbiga, maxaa yeelay, isagu waa Ilaahayo. 19 Markaasaa
Yashuuca wuxuu dadkii ku yidhi, Rabbiga uma aad adeegi
kartaan; waayo, isagu waa Ilaah quduus ah; oo waa Ilaah
masayr ah, oo isagu idinkama cafiyi doono xadgudubkiinna
iyo dembiyadiinna toona. 20 Oo markuu wax wanaagsan idiin
sameeyo dabadeed, haddaad Rabbiga ka tagtaan, oo aad
u adeegtaan ilaahyo qalaad, de markaas wuu soo jeesan
doonaa oo wax xun buu idinku samayn doonaa, oo wuu idin
baabbi'in doonaa. 21 Markaasaa dadkii waxay Yashuuca ku
yidhaahdeen, Maya; laakiinse annagu Rabbiga waannu u
adeegi doonnaa. 22 Yashuucana wuxuu dadkii ku yidhi, Idinka
qudhiinnaa isku marag furaya inaad doorateen Rabbiga
oo aad isaga u adeegaysaan. Kolkaasay yidhaahdeen,
Annagaa ka marag ah. 23 Kolkaasuu yidhi, Haddaba
iska fogeeya ilaahyada qalaad oo idinku dhex jira, oo
qalbigiinna u jeediya Rabbiga ah Ilaaha reer binu Israa'iil. 24
Markaasaa dadkii waxay Yashuuca ku yidhaahdeen, Annagu
waxaannu u adeegi doonnaa Rabbiga Ilaahayaga ah, oo
weliba codkiisaannu maqli doonnaa. 25 Taas daraaddeed
maalintaas ayaa Yashuuca dadkii axdi la dhigtay, oo Shekem
buu ugu dejiyey qaynuun iyo amar. 26 Markaasaa Yashuuca
erayadan ku qoray kitaabkii sharcigii Ilaah; oo dhagax weyn
buu qaaday, oo wuxuu hoos qotonshay geedkii ku ag yiil
taambuugga quduuskaa oo Rabbiga. 27 Yashuucana wuxuu
dadkii oo dhan ku yidhi, Bal ogaada, dhagaxanaa inagu
marag furi doonee; waayo, wuxuu maqlay erayadii Rabbiga
oo uu inagula hadlay oo dhan; sidaas daraaddeed wuxuu
idinku noqon doonaa marag, si aydnaan Ilaahiinna u inkirin.
28 Markaasaa Yashuuca dadkii kala diray oo nin waluba
wuxuu tegey dalkii dhaxalkiisa ahaa. 29 Oo taas dabadeed
addoonkii Rabbiga oo ahaa Yashuuca ina Nuun ayaa dhintay,
isagoo jira boqol iyo toban sannadood. 30 Oo waxay ku
aaseen dalkii uu dhaxalka u helay oo ahaa Timnad Serah
oo ku tiil dalkii buuraha lahaa oo reer Efrayim, oo xagga
woqooyi ka xigta buurta Gacash. 31 Reer binu Israa'iilna
Rabbigay u adeegi jireen waagii Yashuuca oo dhan, iyo
waagii odayaashii ka nolol dambeeyey Yashuuca oo dhan,
kuwaas oo ogaa kulli shuqulkii Rabbigu u sameeyey reer
binu Israa'iil. 32 Oo lafihii Yuusuf oo reer binu Israa'iil ka
soo saareen Masar, waxay ku aaseen Shekem taasoo ah
dhulkii yaraa oo Yacquub ka iibsaday reer Xamoor oo ahaa
Shekem aabbihiis oo uu ka siistay boqol gogo' oo lacag ah;
oo meeshaasu waxay dhaxal u noqotay reer Yuusuf. 33 Oo
Elecaasaar ina Haaruunna wuu dhintay, oo waxay isna ku
aaseen buurtii wiilkiisa Fiinexaas oo isaga laga siiyey dalkii
buuraha lahaa oo reer Efrayim.

# Xaakinnada

1 Markii Yashuuca dhintay dabadeed ayay reer binu
Israa'iil Rabbiga weyddiiyeen, oo yidhaahdeen, Yaa
marka hore xagga reer Kancaan noo hor kici doona oo noo
dagaal geli doona? 2 Markaasaa Rabbigu wuxuu ku yidhi,
Reer Yahuudah ha baxeen, oo anna dalka gacantoodaan
geliyey. 3 Markaasaa reer Yahuudah waxay ku yidhaahdeen
walaalahood reer Simecoon, Kaalaya oo markayaga na
raaca aynu la dagaallanno reer Kancaane; oo annana sidaas
oo kale markiinnaan idin raaci doonnaaye. Markaasay reer
Simecoon raaceen. 4 Kolkaasay reer Yahuudah tageen,
oo Rabbiguna wuxuu gacantoodii geliyey reer Kancaan
iyo reer Feris, oo waxay Beseq kaga laayeen toban kun
oo nin. 5 Oo waxay Beseq ka heleen Adonii Beseq, oo
way la dagaallameen, oo waxay laayeen reer Kancaan
iyo reer Feris. 6 Laakiinse Adonii Beseq waa cararay, oo
iyana way eryoodeen, wayna qabteen isagii, oo waxay
ka gooyeen suulashiisii gacmaha iyo kuwiisii lugaha. 7
Markaasaa Adonii Beseq wuxuu yidhi, Toddobaatan boqor
oo suulashoodii gacmaha iyo kuwoodii lugahu ka go'an yihiin
ayaa cuntadooda ka urursan jiray miiskayga hoostiisa; oo
sidii aan yeelay ayaa Rabbigu ii abaalmariyey. Markaasay
isagii keeneen Yeruusaalem, oo halkaasuu ku dhintay. 8
Oo Reer Yahuudah waxay la dirireen reer Yeruusaalem, oo
intay magaaladii qabsadeen ayay dadkeedii ku laayeen seef,
magaaladiina dab bay qabadsiiyeen. 9 Oo dabadeedna
reer Yahuudah waxay u kaceen inay la diriraan reer
Kancaankii degganaa dalkii buuraha lahaa, iyo kuwii xagga
koonfureed, iyo kuwii degganaa dalkii dooxada ahaa. 10 Oo
reer Yahuudah waxay ku duuleen dadkii reer Kancaan oo
degganaa Xebroon, (oo waagii hore Xebroon magaceeda
waxaa la odhan jiray Qiryad Arbac), oo waxay laayeen
Sheeshay iyo Axiiman iyo Talmay. 11 Oo intay halkaas
ka tageen ayay dadkii degganaa Debiir ku duuleen. (Oo
waagii hore Debiir magaceedu wuxuu ahaa Qiryad Sefer).
12 Markaasaa Kaaleeb wuxuu yidhi, Kii la dirira Qiryad Sefer
oo qabsada, kaas waxaan u guurin doonaa gabadhayda
Caksaah. 13 Markaasaa Cotnii'eel ina Qenas, kaasoo ahaa
Kaaleeb walaalkiisii yaraa, magaaladii qabsaday; markaasuu
wuxuu u guuriyey gabadhiisii Caksaah. 14 Oo markay u
timid ayay kula talisay inuu aabbeheed berrin ka baryo;
markaasay dameerkeedii ka soo degtay, oo Kaaleeb wuxuu
ku yidhi iyadii, Maxaad doonaysaa? 15 Markaasay ku tidhi, Ii
ducee, oo waxaad i siisaa ilo biyo ah, maxaa yeelay, waxaad
i siisay dalkii koonfureed. Kolkaasaa Kaaleeb wuxuu siiyey
ilihii sare iyo kuwii hooseba. 16 Markaasay kii reer Qeyn
oo ahaa Muuse seeddigiis reerkiisii ka tageen magaaladii
lahayd geedaha timirta ah, oo waxay reer Yahuudah u
raaceen xagga cidladii reer Yahuudah taasoo ku taal Caraad
xaggeeda koonfureed; oo intay tageen ayay dadkii la degeen.
17 Oo reer Yahuudahna waxay raaceen walaalahood reer
Simecoon, oo waxay laayeen reer Kancaan oo Sefad
degganaa, oo dhammaanteedna way baabbi'iyeen. Oo
magaaladii magaceediina waxaa la odhan jiray Xormaah.
18 Oo reer Yahuudah waxay qabsadeen haddana Gaasa
iyo xuduudkeedii, iyo Ashqeloon iyo xuduudkeedii, iyo
Ceqroon iyo xuduudkeedii. 19 Oo Rabbigu waa la jiray reer
Yahuudah, oo wuxuu hortooda ka eryay dadkii degganaa
dalkii buuraha lahaa; maxaa yeelay, ma ay eryi karin dadkii
dooxadii degganaa, waayo, waxay lahaayeen gaadhifardood
bir ah. 20 Oo markaasay Xebroon siiyeen Kaaleeb, sidii
Muuse markii hore u sheegay; oo halkaas wuxuu ka eryay
Canaaq saddexdiisii wiil. 21 Oo reer Benyaamiin ma ay eryin
dadkii reer Yebuus oo Yeruusaalem degganaa; laakiinse
reer Yebuus waxay Yeruusaalem la degganaayeen reer
Benyaamiin ilaa maantadan la joogo. 22 Oo reer Yuusufna
waxay ku kaceen Beytel; oo Rabbiguna wuu la jiray iyagii.
23 Oo reer Yuusufna waxay Beytel u direen ilaallo soo
basaasta. (Magaaladaas markii hore waxaa magaceeda
la odhan jiray Luus.) 24 Markaasaa ilaaladii waxay arkeen
nin magaalada ka soo baxaya, oo waxay ku yidhaahdeen,
Waannu ku baryaynaaye, na tus iridda magaalada laga galo,
oo annaguna wanaag baannu kuu falaynaa. 25 Markaasuu
iyagii tusay iriddii magaalada laga geli jiray, oo waxay dadkii
magaalada ku laayeen seef, laakiinse ninkii iyo xaaskiisii oo
dhanba way iska sii daayeen. 26 Markaasaa ninkii wuxuu
tegey dalkii reer Xeed, oo halkaasuu magaalo ka dhisay, oo
magaceediina wuxuu u bixiyey Luus, kaasoo ah magaceeda
ilaa maantadan la joogo. 27 Oo reer Manasehna ma ay
eryin dadkii degganaa Beytshe'aan iyo magaalooyinkeedii,
ama kuwii Tacanaag iyo magaalooyinkeedii, ama dadkii
degganaa Door iyo magaalooyinkeedii, ama dadkii degganaa
Yiblecaam iyo magaalooyinkeedii, ama dadkii degganaa
Megiddoo iyo magaalooyinkeedii, laakiinse reer Kancaan
waxay doonayeen inay dalkaas degganaadaan. 28 Oo
markii ay reer binu Israa'iil xoogaysteen ayay reer Kancaan
addoonsadeen oo mana ay wada eryin. 29 Oo reer Efrayimna
ma ay eryin dadkii reer Kancaan oo degganaa Geser;
laakiinse reer Kancaan iyagay la degganaayeen Geser. 30
Oo reer Sebulunna ma ay eryin dadkii degganaa Qitroon,
iyo dadkii degganaa Nahalaal, laakiinse reer Kancaan
waxay degganaayeen iyaga dhexdooda, oo addoommo
ayay u noqdeen. 31 Oo reer Aasheerna ma ay eryin dadkii

degganaa Cakoo, ama dadkii degganaa Siidoon, ama kuwii
Axlaab, ama kuwii Aksiib, ama kuwii Xelbaah, ama kuwii
Afiiq, ama kuwii Rexob. **32** Laakiinse reer Aasheer waxay
dhex degganaayeen reer Kancaan oo ahaa dadkii dalka
degganaa, maxaa yeelay, iyagu ma ay eryin. **33** Oo reer
Naftaalina ma ay eryin dadkii degganaa Beytshemesh ama
dadkii degganaa Beytcanaad; laakiinse wuxuu degganaa
reer Kancaan dhexdooda, kuwaasoo ahaa dadkii dalka
degganaa; habase yeeshee dadkii degganaa Beytshemesh
iyo Beytcanaad addoommo ayaa u noqdeen iyaga. **34**
Markaasaa reer Amor waxay ku dirqiyeen reer Daan dalkii
buuraha ahaa, maxaa yeelay, ma ay u oggolaan inay u soo
degaan xagga dooxada. **35** Laakiinse reer Amor waxay
doonayeen inay degganaadaan Buur Xeres oo ku taal
Ayaaloon iyo Shacalbiim; laakiinse waxaa ka adkaatay
gacantii reer Yuusuf, oo sidaas daraaddeed addoommo
ayay u noqdeen. **36** Oo xuduudkii reer Amorna wuxuu ka
bilaabmayay meesha laga koro Caqrabbiim marka laga
bilaabo Selac iyo inta ka sarraysa.

**2** Markaasaa malaa'igtii Rabbigu waxay ka soo kacday
Gilgaal oo Bokiim timid, oo waxay tidhi, Anigaa idinka
soo bixiyey dalkii Masar, oo waxaan idin keenay dalkii aan
ugu dhaartay awowayaashiin, oo waxaan idhi, Anigu weligay
jebin maayo axdigayga aan idinla dhigtay. **2** Idinkuna waa
inaydnaan axdi la dhigan dadka dalkan deggan; oo waa
inaad jejebisaan meelahooda allabariga. Laakiinse idinku
ma aydnaan dhegaysan codkaygii. De haddaba maxaad
sidan u yeesheen? **3** Sidaas daraaddeed waxaa kaloo aan
idhi, Hortiinna kama eryi doono iyaga, laakiinse waxay idinku
noqon doonaan sida qodxan dhinacyada idinkaga jirta, oo
ilaahyadooduna waxay idinku noqon doonaan dabin. **4** Oo
markay malaa'igtii Rabbigu erayadan kula hadashay reer
binu Israa'iil oo dhan ayay dadkii codkoodii kor u qaadeen
oo ooyeen. **5** Oo meeshaas magaceedii waxay u bixiyeen
Bokiim; oo halkaasay allabari Rabbiga ugu bixiyeen. **6**
Haddaba markii Yashuuca dadkii diray ayaa reer binu Israa'iil
mid waluba u kacay dhaxalkiisii inuu hantiyo dalka. **7** Oo
dadkuna Rabbigay u adeegeen wakhtigii Yashuuca noolaa oo
dhan, iyo wakhtigii odayaashii Yashuuca ka nolol dambeeyey
oo dhan, kuwaasoo wada arkay kulli shuqulkii weynaa oo
Rabbigu u sameeyey reer binu Israa'iil. **8** Yashuuca oo ahaa
ina Nuun oo addoonkii Rabbiga ahaa wuxuu dhintay isagoo
boqol iyo toban sannadood jira. **9** Oo waxay ku aaseen
dalkii uu dhaxalka u helay oo ahaa Timnad Xeres, oo ku tiil
dalkii buuraha lahaa oo reer Efrayim, oo xagga woqooyi
ka xigta buurta Gacash. **10** Oo weliba dadkii qarnigaas oo
dhammu waxay ku darmadeen awowayaashood; oo waxaa
ka daba kacay kuwo qarni kale ah oo aan aqoon Rabbiga,
ama shuqulkii uu u sameeyey reer binu Israa'iil. **11** Oo
reer binu Israa'iil waxay sameeyeen wax Rabbiga hortiisa
ku xun, oo waxay u adeegeen Bacaliimka. **12** Wayna ka
tageen Rabbigii ahaa Ilaahii awowayaashood oo iyaga ka
soo bixiyey dalkii Masar, oo waxay raaceen ilaahyo kale,
kuwaasoo ahaa ilaahyadii dadkii iyaga ku wareegsanaa,
wayna u sujuudeen; oo Rabbigana way ka xanaajiyeen.
**13** Oo intay Rabbiga ka tageen ayay u adeegeen Bacal
iyo Cashtarod. **14** Markaasaa cadhadii Rabbigu aad ugu
kululaatay reer binu Israa'iil, oo wuxuu iyagii ku riday kuwii
iyaga dhacay gacmahoodii, oo wuxuu ka iibiyey gacmihii
cadaawayaashoodii ku wareegsanaa, sidaas daraaddeed
mar dambe ma ay hor istaagi karin cadaawayaashooda.
**15** Oo meel kasta oo ay tageenba gacanta Rabbigu dhib
bay u ahayd, sidii Rabbigu ku hadlay, iyo sidii Rabbigu
iyaga ugu dhaartay; oo iyana aad bay u dhibaataysnaayeen.
**16** Markaasaa Rabbigu wuxuu kiciyey xaakinno iyaga
ka badbaadiyey gacantii kuwii dhacayay. **17** Oo weliba
xaakinnadoodiina ma ay dhegaysan, maxaa yeelay, ilaahyo
kalay raaceen sidii naag ninkeedii ka dhillowday, wayna
u sujuudeen; oo haddiiba gees bay uga leexdeen jidkii
ay awowayaashood mareen iyagoo addeecaya amarradii
Rabbiga; laakiinse iyagu sidaas ma ay yeelin. **18** Oo
markii Rabbigu iyaga u kiciyey xaakinno ayuu Rabbigu
la jiray xaakinkii, oo wakhtigii xaakinkii noolaa oo dhan
wuxuu iyagii ka badbaadiyey gacantii cadaawayaashooda;
waayo, Rabbigu wuxuu ka qoomamooday taahiddii ay ka
taahayeen kuwii iyaga dulmay oo caddibay. **19** Oo haddana
markii xaakinkii dhintay ayay dib u noqdeen, oo waxay ku
kaceen wax ka sii xun wixii awowayaashood ay ku kici
jireen, oo waxay raaceen ilaahyo kale inay u adeegaan
oo ay u sujuudaan. Kama ay joogsan falimahoodii, iyo
madax adkaantoodii. **20** Oo cadhadii Rabbigu aad bay ugu
kululaatay reer binu Israa'iil, oo wuxuu yidhi, Quruuntanu way
ku xadgudbeen axdigii aan ku amray awowayaashood, oo
codkaygiina ma ay dhegaysan; **21** sidaas daraaddeed hadda
ka dib ka eryi maayo hortooda mid ka mid ah quruumihii
Yashuuca ka tegey markuu dhintay; **22** si aan iyaga ugu
tijaabiyo reer binu Israa'iil bal inay xajiyaan oo ku socdaan
jidka Rabbiga, sidii ay awowayaashood u xajiyeen iyo in kale.
**23** Sidaas daraaddeed Rabbigu wuu daayay quruumahaas,
oo degdegna uma eryin; oo weliba iyagii sooma uu gelin
gacantii Yashuuca.

**3** Haddaba kuwanu waa quruumihii Rabbigu u daayay inuu
reer binu Israa'iil ku tijaabiyo, oo waxay ahaayeen in
alla intii aan ogayn dagaalladii reer Kancaan oo dhan; **2**
inay reer binu Israa'iil ogaadaan oo uu iyaga baro dagaal
ayan waxba ka aqoon jirin. **3** Oo kuwaasu waxay ahaayeen
shantii amiir oo reer Falastiin, iyo reer Kancaan oo dhan, iyo
reer Siidoon, iyo reer Xiwi, oo degganaa Buur Lubnaan,
iyo tan iyo Buur Bacal Xermoon, iyo tan iyo meesha laga
galo Xamaad. **4** Oo kuwaas waxaa loo daayay in reer binu
Israa'iil lagu tijaabiyo, in la ogaado bal inay dhegaysanayaan
amarradii Rabbiga oo uu ku amray awowayaashood oo
uu Muuse soo faray iyo in kale. **5** Oo reer binu Israa'iil
waxay dhex degeen reer Kancaan, kuwaas oo ahaa reer
Xeed, iyo reer Amor, iyo reer Feris, iyo reer Xiwi, iyo
reer Yebuus. **6** Oo gabdhahoodiina way ka guursadeen,
oo kuwoodiina wiilashoodii bay u guuriyeen, oo waxay u
adeegeen ilaahyadoodii. **7** Oo reer binu Israa'iilna waxay
sameeyeen wax Rabbiga hortiisa ku xun, oo Rabbiga
Ilaahooda ahna way illoobeen, wayna u adeegeen Bacaliimkii
iyo geedihii Asheeraah. **8** Sidaas daraaddeed cadhadii
Rabbigu aad bay ugu kululaatay reer binu Israa'iil, oo
wuxuu iyagii ka iibiyey boqorkii Mesobotamiya oo ahaa
Kuushan Rishcaatayim; oo reer binu Israa'iil waxay Kuushan
Rishcaatayim u adeegayeen siddeed sannadood. **9** Oo markii
reer binu Israa'iil ay Rabbiga u qayshadeen, Rabbigu wuxuu
reer binu Israa'iil u kiciyey badbaadiye, kaasoo badbaadiyey,
oo wuxuu ahaa Cotnii'eel ina Qenas oo ahaa Kaaleeb
walaalkiisii yaraa. **10** Oo kaas waxaa ku soo degay Ruuxa
Rabbiga, oo wuxuu xukumi jiray reer binu Israa'iil. Dagaal
buuna u baxay, oo Rabbiguna wuxuu gacantiisii u geliyey
boqorkii Mesobotamiya oo ahaa Kuushan Rishcaatayim,
oo isna wuu ka gacan sarreeyey Kuushan Rishcaatayim.
**11** Markaasaa dalkii xasilloonaa afartan sannadood. Oo
Cotnii'eel ina Qenas wuu dhintay. **12** Oo reer binu Israa'iil mar
kalay sameeyeen wax Rabbiga hortiisa ku xun; markaasaa
Rabbigu wuxuu xoog u yeelay oo reer binu Israa'iil ku diray
boqorkii reer Moo'aab oo ahaa Cegloon, maxaa yeelay,
waxay sameeyeen wax Rabbiga hortiisa ku xun. **13** Oo isna
wuxuu soo urursaday reer Cammoon iyo reer Camaaleq;
kolkaasuu intuu tegey laayay reer binu Israa'iil, oo waxay
qabsadeen magaaladii lahayd geedo timireedka. **14** Oo reer
binu Israa'iil waxay boqorkii reer Moo'aab oo Cegloon ahaa
u adeegayeen siddeed iyo toban sannadood. **15** Laakiinse
markii reer binu Israa'iil ay Rabbiga u qayshadeen, Rabbigu
wuxuu u kiciyey badbaadiye, kaasoo ahaa Eehuud ina
Geeraa, oo reer Benyaamiin, oo ahaa nin gurran. Isaga
ayay reer binu Israa'iil hadiyad ugu soo dhiibeen Cegloon
kii ahaa boqorkii reer Moo'aab. **16** Oo Eehuudna wuxuu
samaystay seef laba af leh, oo dhererkeedu yahay dhudhun,
oo wuxuu ku xidhay meel dharkiisa ka hoosaysa oo ah
bowdadiisa midig. **17** Oo wuxuu hadiyaddii u dhiibay boqorkii
reer Moo'aab oo ahaa Cegloon; Cegloonna wuxuu ahaa
nin aad u buuran. **18** Oo markuu dhammeeyey bixintii
hadiyadda ayuu diray dadkii hadiyadda siday. **19** Laakiinse
Eehuud wuxuu ka soo noqday dhagaxyadii qorqornaa Gilgaal
agteeda, oo wuxuu yidhi, Boqorow, anigu waxaan kuu wadaa
farriin qarsoon. Markaasuu yidhi, Iska aamus. Oo dadkii
hareerihiisa taagnaa oo dhammuna dibadday uga baxeen
isagii. **20** Markaasaa Eehuud u yimid isagii; oo isna wuxuu
keligiis fadhiyey qowladdii uu ku laydhsan jiray, markaasaa
Eehuud wuxuu ku yidhi, Waxaan farriin kaaga wadaa Ilaah.
Markaasuu ka soo kacay kursigiisii. **21** Oo Eehuudna wuxuu
soo bixiyey gacantiisii bidix, oo wuxuu seeftii kala soo baxay
dhinaca bowdadiisii midig, markaasuu Cegloon caloosha
kaga muday, **22** oo xataa daabkiina waa galay afkii dabadiis,
oo seefta afkeediina waxaa qariyey xaydhii, waayo, seeftii
kama uu soo bixin calooshiisii; oo uus baa ka yimid. **23**
Markaasaa Eehuud wuxuu u baxay xagga qolqolka, oo uu
soo xidhay qowladda albaabbadeedii, wuuna qufulay. **24**
Haddaba markuu tegey waxaa yimid addoommadii Cegloon,
markaasay intay wax fiiriyeen arkeen albaabbadii qowladda
oo qufulan; kolkaasay waxay isyidhaahdeen, Hubaal wuu
isku deday qowladdiisa uu ku laydhsado. **25** Oo way
sugeen ilaa ay isla yaabeen; oo bal eeg isna albaabbadii
qowladda ma uu furin, sidaas daraaddeed furahay qaadeen
oo albaabbaday fureen, oo markaasay arkeen sayidkoodii oo
dhulka ku dhacay oo meyd ah. **26** Eehuudna waa baxsaday
intay sugayeen, oo wuxuu dhaafay dhagaxyadii qorqornaa,
oo wuxuu u fakaday xagga Seciiraah. **27** Oo markuu yimid
dalkii buuraha lahaa oo reer Efrayim ayuu afuufay buun, oo
reer binu Israa'iilna isagay kala dhaadhaceen dalkii buuraha
lahaa, oo isna wuu hor socday. **28** Oo wuxuu ku yidhi, I
soo raaca, waayo, Rabbigu gacantiinnuu soo geliyey reer
Moo'aab oo cadaawayaashiinnii ah. Oo iyana isagay ka
daba dhaadhaceen, oo waxay reer Moo'aab ka qabsadeen
meeshii webiga Urdun laga gudbi jiray, oo ninna uma ay
oggolaan inuu ka gudbo. **29** Oo markaasay reer Moo'aab ka
laayeen rag toban kun ku dhow, kuwaas oo ahaa kuwo xoog
wada leh, oo xataa nin keliyuhu kama baxsan. **30** Sidaasay
reer Moo'aab ku hoos galeen reer binu Israa'iil; dalkiina wuu
xasilloonaa siddeetan sannadood. **31** Oo isagii ka dibna
waxaa kacay Shamgar ina Canaad, kaasoo reer Falastiin lix
boqol oo nin kaga laayay usha dibida lagu shuqeeyo, oo
isaguna reer Israa'iil wuu badbaadiyey.

**4** Oo reer binu Israa'iil waxay haddana sameeyeen wax
Rabbiga hortiisa ku xun, markii uu Eehuud dhintay
dabadeed. **2** Oo Rabbigu wuxuu iyagii ka iibiyey boqorkii
reer Kancaan oo ahaa Yaabiin oo xukumi jiray Xaasoor; oo
sirkaalkii ciidankiisu wuxuu ahaa Siiseraa kaas oo degganaa
Xaroshed tii Quruumaha. **3** Oo reer binu Israa'iilna waxay
u qayshadeen Rabbiga, waayo, ninkaasu wuxuu lahaa
sagaal boqol oo gaadhifardood oo bir ah, oo kaasu labaatan
sannadood buu reer binu Israa'iil aad u cadaadinayay. **4**
Oo waagaas waxaa reer binu Israa'iil xaakimad u ahayd
Debooraah, naagtii Lafiidood, taasoo nebiyad ahayd. **5** Oo
waxay hoos fadhiyi jirtay geedkii timirta ahaa oo Debooraah,
oo u dhexeeyey Raamaah iyo Beytel, oo ku yiil dalkii buuraha
lahaa oo reer Efrayim; oo reer binu Israa'iilna iyaday ugu
iman jireen inay u gar naqdo. **6** Oo iyana cid bay u dirtay,
oo Baaraaq ina Abiinocam ayay uga yeedhay Qedesh
Naftaali, oo waxay ku tidhi, Miyaan Rabbiga Ilaaha reer binu
Israa'iil ahu kugu amrin, oo kugu odhan, Tag oo u dhowow
Buur Taaboor, oo waxaad kaxaysataa toban kun oo nin
oo ah reer Naftaali iyo reer Sebulun? **7** Oo anna waxaan
Webi Qiishoon kuugu soo dhowayn doonaa Siiseraa oo
ah sirkaalka ciidanka Yaabiin, isaga iyo gaadhifardoodkiisa
iyo dadkiisa badanba oo gacantaadaan gelin doonaa. **8**
Markaasaa Baaraaq wuxuu ku yidhi, Haddaad i raacdid,
waan tegi doonaa, laakiinse haddaanad i raacin, tegi maayo.
**9** Kolkaasay ku tidhi, Hubaal waan ku raacayaa; habase
yeeshee socdaalka aad tegaysaa ahaan maayo mid adiga
sharaf kuu leh, waayo, Rabbigu wuxuu Siiseraa ka iibin
doonaa naag gacanteed. Kolkaasay Debooraah kacday oo
Baaraaq u raacday xagga Qedesh. **10** Markaasaa Baaraaq
wuxuu Qedesh isugu yeedhay reer Sebulun iyo reer Naftaali;
oo waxaa isaga raacay toban kun oo nin; oo Debooraahna
isagay raacday. **11** Haddaba Xeber oo ahaa reer Qeyn
ayaa hore isaga soocay reer Qeyn, kuwaas oo ahaa reer
Xoobaab, Muuse seeddigiis, oo wuxuu meel iyaga ka fog
teendhadiisii ka dhistay xagga geedkii ku yiil Sacananniim
oo u dhow Qedesh. **12** Oo waxay Siiseraa u sheegeen, inuu
Baaraaq ina Abiinocam koray Buur Taaboor. **13** Markaasaa
Siiseraa wuxuu gaadhifardoodkiisii oo dhan, kuwaasoo ahaa
sagaal boqol oo gaadhifardood oo bir ah, iyo kulli dadkii
isaga la joogay oo dhan, ka soo wada urursaday Xaroshed
tii Quruumaha, oo wuxuu ku soo urursaday Webi Qiishoon.
**14** Oo Debooraahna waxay Baaraaq ku tidhi, Kac, waayo,
maanta waa maalintii Rabbigu Siiseraa gacantaada soo
geliyey. Rabbigu miyaanu ku hor socon? Sidaas daraaddeed
Baaraaq wuxuu ka dhaadhacay Buur Taaboor, isagoo ay
toban kun oo nin daba socdaan. **15** Oo Rabbigu wuxuu
seef ku dhibay Siiseraa, iyo gaadhifardoodkiisii oo dhan,
iyo ciidankiisii oo dhan Baaraaq hortiisa; oo Siiseraa intuu
ka degay gaadhifaraskiisii ayuu cagihiisii ku cararay. **16**
Laakiinse Baaraaq wuxuu eryooday gaadhifardoodkii iyo
ciidankii ilaa Xaroshed tii Quruumaha; oo Siiseraa ciidankiisii
oo dhan waxaa lagu laayay seef, oo xataa nin keliyuhu
kama hadhin. **17** Laakiinse Siiseraa cagihiisuu ugu cararay
teendhadii Yaaceel taasoo ahayd naagtii Xeber kii reer Qeyn,
waayo, nabad baa ka dhexaysay boqorkii Xaasoor oo ahaa
Yaabiin iyo reerkii Xeber kii reer Qeyn. **18** Oo Yaaceelna
intay dibadda u soo baxday inay ka hor tagto Siiseraa,
waxay isagii ku tidhi, Soo leexo, sayidkaygiiyow, ii soo
leexo, oo ha cabsan. Oo isna intuu ku leexday ayuu galay
teendhada, oo markaasay buste ku dedday. **19** Markaasuu
wuxuu iyadii ku yidhi, Waan ku baryayaaye, i sii in yar
oo biyo ah oo aan cabbo, waayo, waan harraadsanahay.
Kolkaasay u soo furtay sibraar caano ah, oo intay dhansiisay
ayay haddana dedday isagii. **20** Markaasuu wuxuu iyadii
ku yidhi, Teendhada iriddeeda istaag, oo haddii dad kuu
yimaado oo ay i kaa weyddiiyaan, oo ku yidhaahdaan,
Halkan nin ma jooga? waxaad ku tidhaahdaa, Maya. **21**
Markaasaa naagtii Xeber oo ahayd Yaaceel ayaa qaadatay
qori dhidib ah, oo gacantana waxay ku qabsatay dubbe, oo
intay tartiib ugu dhowaatay ayay dhidibkii kaga dhufatay
dhafoorka, oo intuu dhidibkii ka dusay ayuu dhulka muday,
maxaa yeelay, isagu hurdo weyn buu ku jiray oo aad buu u
daalay, oo sidaasuu u dhintay. **22** Oo bal eeg, Baaraaq intuu
raacdaynayay Siiseraa, ayay Yaaceel u soo baxday inay
isagii ka hor timaado, oo waxay ku tidhi, Bal kaalay oo waan
ku tusi ninkaad doonaysid. Markaasuu u yimid, oo wuxuu
arkay Siiseraa oo jiifa oo meyd ah, oo dhafoorkiisa dhidib ka
taagan yahay. **23** Sidaasaa Ilaah maalintaas boqorkii reer
Kancaan oo ahaa Yaabiin ugu hoosaysiiyey reer binu Israa'iil
hortooda. **24** Oo gacantii reer binu Israa'iil aad iyo aad bay
uga sii adkaanaysay boqorkii reer Kancaan oo Yaabiin ahaa,
ilaa ay baabbi'iyeen boqorkii reer Kancaan oo Yaabiin ahaa.

**5** Deedna maalintaas waxaa gabyay Debooraah iyo Baaraaq
ina Abiinocam, oo waxay yidhaahdeen, **2** Madaxdii baa
reer binu Israa'iil hoggaamisay, Dadkiina iyagoo oggol ayay
isbixiyeen, Taas aawadeed Rabbiga ammaana. **3** Bal maqla,
Boqorradow; oo dhegaysta, Amiirradow, Anigu anaa u gabyi
doona Rabbiga; Ammaan baan ugu gabyi doonaa Rabbiga
ah Ilaaha reer binu Israa'iil. **4** Rabbiyow, markaad Seciir
ka baxday, Iyo markaad ku socotay berrinkii Edom, Ayaa
dhulku gariiray, oo samadiina waa soo da'day, Daruurihiina
biyay soo daadsheen. **5** Buurihiina way u gariireen Rabbiga

aawadiis, Xataa Siinaydaasu way u gariirtay Rabbiga ah
Ilaaha reer binu Israa'iil aawadiis. **6** Wakhtigii Shamgar ina
Canaad, Iyo wakhtigii Yaaceel, jidadka waaweynu cidlay
ahaayeen, Oo socotooyinkuna waxay mari jireen waddooyin
qalqalloocan. **7** Taliyayaashu way ka joogsadeen reer binu
Israa'iil, Way joogsadeen ilaa aan anigoo Debooraah ahu
kacay, Ilaa aan kacay anigoo reer binu Israa'iil hooyo u ah.
**8** Waxay doorteen ilaahyo cusub; Oo markaasaa dagaal
irdaha ka dhacay. Afartan kun oo reer binu Israa'iil Ma lagu
arkay gaashaan ama waran? **9** Qalbigaygu wuxuu la jiraa
taliyayaasha reer binu Israa'iil, Kuwaasoo iyagoo oggol isku
bixiyey dadka dhexdiisa. Rabbiga ammaana. **10** Bal taas ka
warama kuwiinna dameerraha cadcad fuushan, Iyo kuwiinna
ku fadhiya gogosha wanaagsan, Iyo kuwiinna jidka marow.
**11** Meelaha biyaha laga dhaansado, oo ka fog qaylada
qaansoleyda, Halkaasay ka maqashiin doonaan falimihii
Rabbiga oo xaqa ahaa, Kuwaas oo ahaa falimihii xaqa
ahaa oo uu ku xukumay reer binu Israa'iil. Taas ka dibna
dadkii Rabbigu waxay tageen xagga irdaha. **12** Toos, toos,
Debooraahoy; Toos, toos, oo gabay ku gabay; Baaraaqow,
kac, oo kaxayso maxaabiistaada, ina Abiinocamow. **13**
Markaasay raggii gobta ahaa intiisii hadhay iyo dadkii soo
degeen; Rabbigu waa ii yimid oo wuxuu iiga hiiliyey kuwii
xoogga badnaa. **14** Reer Efrayim waxaa ka soo baxay
kuwo xididkoodii yahay Camaaleq; Dabadeedna, adiga
reer Benyaamiinow, iyo dadkaaga kugu dhex jira, Oo reer
Maakiirna waxaa ka soo baxay taliyayaal, Reer Sebulunna
waxaa ka yimid kuwo haya usha sirkaalka wax qora. **15**
Oo amiirradii reer Isaakaarna waxay la jireen Debooraah;
Oo sidii reer Isaakaar ahaa ayaa Baaraaqna ahaa; Oo
xagga dooxada ayay u ordeen iyagoo daba socda. Oo biyo
mareenka reer Ruubeen agtiisa Wax weyn baa lagu goostay.
**16** Maxaad xeryaha idaha u fadhiday, Inaad maqasho
biilbiilaha idaha u yeedhaya? Biyo mareenka reer Ruubeen
agtiisa Aad baa qalbiyo loogu baadhay. **17** Gilecaad wuxuu
joogay Urdun shishadiisa; Reer Daanna muxuu doonniyaha
ugu hadhay? Reer Aasheer wuxuu weli fadhiyey xeebta
badda, Oo wuxuu ag joogay durdurradiisa. **18** Reer Sebulun
wuxuu ahaa dad geerida isku biimeeyey, Reer Naftaalina
wuxuu isku biimeeyey meelaha dhaadheer oo duurka.
**19** Boqorradii waa yimaadeen oo dirireen, Dabadeedna
boqorradii reer Kancaanna waxay ku dirireen Tacanaag taas
oo u dhow biyaha Megiddoo: Oo lacag faa'iido ah ma ay
qaadan. **20** Waxay kala dirireen xagga samada, Xiddiguhuna
meeshooday Siiseraa kala dirireen. **21** Oo waxaa qaaday
Webi Qiishoon, Webiga duqa ah oo Qiishoon la yidhaahdo.
Naftaydoy, adigoo xoog leh hore u soco. **22** Markaasay
farduhu qoobabkoodii dhulka ku garaacayeen, Maxaa yeelay,
kuwoodii xoogga badnaa ayaa socod doonayay. **23** Oo
malaa'igtii Rabbigu waxay tidhi, Meeroos habaara, Oo aad
u habaara dadka deggan, Maxaa yeelay, uma ay iman
inay Rabbiga caawiyaan Oo ay uga hiiliyaan kuwa xoogga
badan. **24** Waxaa dumarka oo dhan ka barako badnaan
doonta Yaaceel Oo ah Heberkii reer Qeyn naagtiisa, Way ka
barako badnaan doontaa naagaha teendhooyinka deggan.
**25** Biyuu weyddiistay, oo waxay siisay caano; Oo saxan
wanaagsan ayay subag ugu keentay. **26** Oo waxay gacan ku
qabsatay dhidibkii, Oo gacanteedii midigna dubbihii ragga
shaqeeya; Oo waxay dubbihii ku dhufatay Siiseraa, oo
dhidibkii madaxiisay ka dusisay, Haah, waxay ku mudday oo
ka mudhbixisay dhafoorradiisa. **27** Oo cagaheeda agtooda
ayuu ku foororsaday oo dhacay oo jiifsaday: Cagaheeda
agtooda ayuu ku foororsaday oo dhacay: Oo meeshuu ku
foororsaday ayuu ku dhacay isagoo meyd ah. **28** Siiseraa
hooyadiis daaqadday wax ka eegtay oo qaylisay, Shabaggay
ka qaylisay oo tidhi, Maxaa gaadhifaraskiisii u raagay?
Oo maxaa dib u riday giringirihii gaadhifardoodkiisa? **29**
Dumarkeedii caqliga lahaa way jawaabeen, Oo iyana way
isu jawaabtay. **30** Oo waxay tidhi, Miyaanay wax helin oo
boolidii qaybsan? Oo nin kastaaba miyaanu helin gabadh
ama laba gabdhood; Oo Siiseraana sow ma helin dhar booli
ah oo kala midab ah, Oo miyaanu helin daabac kala midab
ah, Oo miyaanu helin daabac kala midab ah oo labada
dhan ku yaal, oo boolida qoortooda sudhan? **31** Rabbiyow,
cadaawayaashaada oo dhammu sidaas ha u halligmeen;
Laakiinse kuwa Rabbiga jecel oo dhammu ha noqdeen
sida qorraxda markay xooggeeda la soo baxdo. Oo dalkiina
afartan sannadood wuu xasilloonaa.

**6** Oo reer binu Israa'iilna waxay sameeyeen wax Rabbiga
hortiisa ku xun; markaasaa Rabbigu wuxuu intii toddoba
sannadood ah gacanta u geliyey reer Midyaan. **2** Oo
gacantii Midyaanna waa ka adkaatay reer binu Israa'iil;
markaasaa reer binu Israa'iil waxay reer Midyaan aawadood
u samaysteen boholo buuraha ku yaal, iyo godad, iyo
dhufaysyo xoog leh. **3** Oo markii reer binu Israa'iil ay
wax beeri jireen, waxaa iman jiray reer Midyaan iyo reer
Camaaleq, iyo reer bariga, wayna ku kici jireen; **4** oo intay ag
degaan ayay ka baabbi'in jireen wixii dhulka uga baxay, ilaa
la soo gaadho Gaasa, oo reer binu Israa'iil ugama ay tegin
wax la quuto, iyo ido, iyo dibi, iyo dameerro toona. **5** Waayo,
waxay la iman jireen xoolahooda iyo teendhooyinkooda, oo
waxay u faro badnaayeen sida ayaxa oo kale. Iyaga iyo
geeloodu midna tiro ma lahayn; oo waxay dalka u iman jireen

inay baabbi'iyaan. 6 Oo reer Midyaan aawadood ayay reer
binu Israa'iil aad iyo aad ugu caydhoobeen; markaasaa reer
binu Israa'iil Rabbiga u qayshadeen. 7 Oo markii reer binu
Israa'iil Rabbiga ugu qayshadeen reer Midyaan aawadood 8
ayaa Rabbigu reer binu Israa'iil u soo diray nebi; oo wuxuu
ku yidhi iyagii, Rabbiga ah Ilaaha reer binu Israa'iil sidan buu
leeyahay, Anaa idinka soo bixiyey dalkii Masar, oo waxaan
idinka soo saaray gurigii addoonsiga; 9 waanan idinka soo
samatabbixiyey gacantii Masriyiinta, iyo gacantii kuwii idin
dulmi jiray oo dhan, oo kulligood intaan hortiinna ka eryay
ayaan dalkoodii idin siiyey; 10 oo waxaan idinku idhi, Anigu
waxaan ahay Rabbiga Ilaahiinna ah, oo waa inaydnaan
ka baqin ilaahyada reer Amor oo aad dalkooda deggan
tihiin; laakiinse idinku ma aydnaan dhegaysan codkaygii. 11
Markaasaa waxaa yimid malaggii Rabbiga, oo wuxuu hoos
fadhiistay geedkii ku yiil Cofraah, oo uu lahaa Yoo'aash kii
reer Abiiceser; oo wiilkiisii Gidcoon ahaa ayaa sarreen ku
tumayay meeshii macsaradda inuu ka qariyo reer Midyaan.
12 Markaasaa malaggii Rabbigu u muuqday, oo wuxuu ku
yidhi, Rabbigu waa kula jiraa, nin yahow xoogga lahu. 13 Oo
markaasaa Gidcoon malaggii ku yidhi, Sayidkaygiiyow, haddii
Rabbigu nala jiro, de maxaa waxyaalahan oo dhammu noogu
dhaceen? Oo meeye kulli shuqulladiisii yaabka lahaa oo ay
awowayaashayo noo sheegeen, oo ay nagu yidhaahdeen,
Miyaanu Rabbigu naga soo bixin dalkii Masar? Laakiinse
haatan Rabbigu waa na xooray, oo wuxuu gacanta noo
geliyey reer Midyaan. 14 Markaasaa Rabbigu isagii eegay,
oo wuxuu ku yidhi, Xooggaagan ku tag, oo reer binu Israa'iil
ka badbaadi gacanta reer Midyaan. Sow kuma aanan dirin?
15 Markaasuu isna wuxuu ku yidhi, Sayidow, maxaan reer
binu Israa'iil ku badbaadiyaa? Bal eeg, reerkaygu waa kan
ugu liita reer Manaseh, oo anna waxaan ahay kan ugu yar
reerka aabbahay. 16 Markaasaa Rabbigu wuxuu ku yidhi,
Hubaal waan kula jirayaa, oo waxaad reer Midyaan u layn
doontaa sida nin keliya. 17 Oo markaasuu wuxuu ku yidhi,
Haddaba haddaad raalli iga tahay, de calaamo i tus inaad
tahay kan ila hadlaya. 18 Waan ku baryayaaye, halkaas
ha ka tegin ilaa aan kuu imaado, oo aan qurbaankayga
kuu keeno, oo aan ku hor dhigo. Isagu wuxuu yidhi, Waan
ku sugayaa ilaa aad soo noqotid. 19 Markaasaa Gidcoon
gudaha galay, oo wuxuu diyaariyey orgi yar, iyo qiyaas
eefaah bur ah oo uu ka sameeyey kibis aan khamiir lahayn.
Hilibkii wuxuu ku riday dambiil, maraqiina dheri buu ku
shubay, oo wuxuu ugu keenay oo ku siiyey geedkii hoostiisa.
20 Markaasaa malaggii Ilaah wuxuu ku yidhi isagii, Hilibka
iyo kibista aan khamiirka lahayn qaad, oo waxaad saartaa
dhagaxan, oo maraqana ku qub. Oo isna sidaasuu yeelay.
21 Markaasaa malaggii Rabbigu wuxuu soo taagay ushii
gacantiisa ku jirtay dabadeedii, oo wuxuu ku taabtay hilibkii
iyo kibistii aan khamiirka lahayn, markaasaa dab ka soo
baxay dhagaxii, oo wuxuu laastay hilibkii iyo kibistii aan
khamiirka lahayn; oo markaasaa malaggii Rabbigu ka libdhay
araggiisii. 22 Markaasaa Gidcoon arkay inuu yahay malaggii
Rabbiga, oo Gidcoon wuxuu yidhi, Waa ii hoog, Sayidow,
Rabbiyow, waayo, malaggii Rabbiga ayaan fool ka fool
u arkay. 23 Kolkaasaa Rabbigu wuxuu ku yidhi isagii,
Nabad ahow, oo ha cabsan, adigu dhiman mayside. 24
Markaasaa Gidcoon halkaas wuxuu Rabbiga uga dhisay
meel allabari, oo wuxuu magaceedii u bixiyey Rabbigu waa
nabad, oo taasu xataa maantadan la joogo waxay ku taal
Cofraah tii reer Abiiceser. 25 Oo isla habeenkaas ayaa
Rabbigu ku yidhi isagii, Kaxayso dibiga aabbahaa, kaasoo
ah dibiga labaad oo toddoba jirka ah, oo waxaad dumisaa
meeshaa allabariga loogu bixiyo Bacal oo aabbahaa haysto,
oo geedaha Asheeraah ku ag yaalna jar; 26 oo Rabbiga
Ilaahaaga ah meel allabari uga dul dhis dhufayskan, oo
hagaaji, oo kexee dibiga labaad, oo geedihii Asheeraah oo
aad gooysay qoryihiisa ku bixi allabari la gubo. 27 Markaasaa
Gidcoon wuxuu soo kaxaystay toban nin oo addoommadiisii
ahaa, oo wuxuu sameeyey wixii Rabbigu u sheegay, oo
shuqulkii habeennimuu sameeyey, maxaa yeelay, wuxuu
ka cabsanayay reerkii aabbihiis iyo dadkii magaalada, oo
taas darteed maalinnimo ma uu samayn karin. 28 Oo dadkii
magaaladu markay aroor hore soo tooseen ayay arkeen in
meeshii allabariga Bacal loogu bixin jiray ay dunsan tahay
iyo in geedihii Asheeraah oo agteeda ku yiil ay salka ka
go'an yihiin, iyo in dibigii labaad lagu dul bixiyey meeshii
allabariga oo loo dhisay. 29 Markaasaa midkoodba wuxuu
kii kale ku yidhi, Yaa waxakan sameeyey? Oo markay
haybiyeen oo dadkii weyddiiyeen ayaa la yidhi, Waxakan
waxaa sameeyey Gidcoon ina Yoo'aash. 30 Markaasaa
dadkii magaaladu waxay Yoo'aash ku yidhaahdeen, Soo
bixi wiilkaaga aan dilnee, waayo, wuxuu dumiyey meeshii
allabariga Bacal loogu bixin jiray, oo geedihii Asheeraah
oo ku ag yiilna salkuu ka gooyay. 31 Markaasaa Yoo'aash
wuxuu ku yidhi dadkii ku kacay oo dhan, Ma idinkaa u
dagaallamaya Bacal? Oo ma isagaad badbaadinaysaan?
Kii u dagaallama ha la dilo subaxda, waayo, hadduu isagu
ilaah yahay, de ha isu dagaallamo, maxaa yeelay, waxaa
laga jebiyey meeshiisii allabariga. 32 Sidaas daraaddeed
wuxuu maalintaas Gidcoon u bixiyey Yerubbacal, oo wuxuu
yidhi, Bacal ha la dagaallamo isaga, maxaa yeelay, wuxuu
ka dumiyey meeshiisii allabariga. 33 Markaasaa waxaa is-
urursaday reer Midyaan, iyo reer Camaaleq, iyo reer barigii

oo dhan, oo intay Webi Urdun ka gudbeen ayay dooxadii
Yesreceel degeen. 34 Laakiinse Ruuxii Rabbigu wuxuu ku
soo degay Gidcoon, markaasuu buun ku dhuftay, oo waxaa
ku soo ururay reer Abiiceser. 35 Oo wuxuu wargeeyayaal
u diray reer Manaseh oo dhan, oo iyana markaasay ku
soo urureen; oo haddana wuxuu wargeeyayaal u diray reer
Aasheer, iyo reer Sebulun, iyo reer Naftaali, oo iyana way u
yimaadeen inay la kulmaan iyagii. 36 Markaasaa Gidcoon
wuxuu Ilaah ku yidhi, Sidaad ii sheegtay, haddaad reer binu
Israa'iil gacantayda ku badbaadinaysid, 37 bal eeg, meesha
sarreenka lagu tumo ayaan dhigayaa dhogor idaad, haddaba
haddii dharab qoyo dhogorta keliya oo dhulka kale oo
dhammuna uu engegnaado, markaasaan ogaanayaa inaad
gacantayda ku badbaadinaysid reer binu Israa'iil, sidaad ku
hadashay. 38 Oo sidii bay noqotay, waayo, markuu toosay
subaxdii dambe, oo tuujiyey dhogorta, wuxuu ka maroojiyey
koob muuggiis oo biyo ah. 39 Markaasaa Gidcoon wuxuu
Ilaah ku yidhi, Cadhadaadu yaanay igu kululaan oo markan
keliya ayaan hadlayaa. Markan keliya aan dhogorta wax ku
hubsado, waan ku baryayaaye. Bal markan dhogorta keliya
engeg ha noqoto, laakiinse dhulka kale oo dhammu dharab
ha lahaado. 40 Oo Ilaahna sidii buu yeelay habeenkaas;
waayo, waxaa engegnaa dhogortii keliya, oo dhulka kale oo
dhammuna dharab buu lahaa.

**7** Markaasay Yerubbacal oo ah Gidcoon iyo dadkii isaga la
jiray oo dhan aroor hore kaceen, oo waxay degeen ishii
Xarod dhinaceeda; oo xeradii reer Midyaanna waxay iyaga ka
xigtay xagga woqooyi oo u dhow buurta Moreh, oo dooxadii
ku dhex tiil. 2 Markaasaa Rabbigu wuxuu Gidcoon ku yidhi,
Dadka kula socdaa way igu badan yihiin inaan reer Midyaan
gacanta u soo geliyo, waayo, waaba intaasoo ay reer binu
Israa'iil ii faanaan, oo ay isyidhaahdaan, Gacantaydaa i
badbaadisay. 3 Haddaba tag oo dadka dhegahooda ku
naadi, oo waxaad ku tidhaahdaa, Ku alla kii baqaya oo
gariirayaa, ha iska noqdo oo ha ka tago Buur Gilecaad.
Markaasaa dadkii waxaa dib uga noqday laba iyo labaatan
kun oo nin, oo waxaa soo hadhay toban kun. 4 Markaasaa
Rabbigu wuxuu Gidcoon ku yidhi, Dadku weli aad buu u
badan yahay; bal waxaad geeysaa biyaha, oo halkaasaan
iyaga kuugu tijaabinayaa, oo waxay noqon doontaa, kii
aan kugu idhaahdo, Kanu ha ku raaco, kaasaa ku raaci
doonaa, oo ku alla kii aan kugu idhaahdo, Kanu ku raaci
maayo, kaasu waa inaanu ku raacin. 5 Sidaas daraaddeed
dadkii wuxuu keenay biyihii; markaasaa Rabbigu Gidcoon ku
yidhi, Ku alla kii biyaha carrabkiisa ku leefleefa sida eey
oo kale, kaas gooni ahaantiisa u sooc, sidaas oo kalena
ku alla kii u jilba joogsada inuu biyaha cabbo isna gooni
ahaantiisa u sooc. 6 Oo kuwii leefleefay oo calaacalahooda
afka saaray tiradoodii waxay noqotay saddex boqol oo nin;
laakiinse dadka intiisii kale way wada jilba joogsadeen inay
biyihii cabbaan. 7 Markaasaa Rabbigu wuxuu Gidcoon ku
yidhi, Saddexda boqol oo nin oo calaacalahooda biyo ka
leefleefay ayaan idinku badbaadinayaa, oo reer Midyaanna
gacantaadaan soo gelinayaa; laakiinse dadka intiisa kale
oo dhammu ha iska tageen, oo nin waluba ha ku noqdo
meeshiisii. 8 Sidaas daraaddeed dadkii waxay gacmahoodii
ku qaateen sahay iyo buunankoodii, oo kulli dadkii reer
binu Israa'iil wuu iska diray, oo nin waluba wuxuu tegey
teendhadiisii, laakiin wuxuu la hadhay saddexdii boqol
oo nin. Oo xeradii reer Midyaanna waxay ku tiil dooxadii
isaga ka hoosaysay. 9 Oo isla habeenkaas Rabbigu wuxuu
Gidcoon ku yidhi, Kac, oo xerada ku dhaadhac, waayo, iyada
gacantaan kuu geliyey. 10 Laakiinse haddaad ka baqaysid
inaad ku dhaadhacdo, waxaad xerada kula dhaadhacdaa
addoonkaaga Furaah, 11 oo waxaad maqli doontaa waxay
isku leeyihiin; oo markaasay gacmahaagu u xoogaysan
doonaan inaad xerada ku dhaadhacdo. Markaasuu hoos
u dhaadhacay isagoo kaxaystay addoonkiisii Furaah ilaa
meeshii ku wareegsanayd xerada oo raggii hubka lahaa
degganaa. 12 Oo reer Midyaan iyo reer Camaaleq iyo
reer barigii oo dhammu waxay ku jireen dooxadii, iyagoo
u faro badan sida ayax oo kale, oo geelooduna tiro ma
lahayn, oo waxay la faro le'ekaayeen cammuudda badda
xeebteeda taal. 13 Oo markuu Gidcoon yimid waxaa jiray nin
saaxiibkiis riyo u sheegayay, oo wuxuu yidhi, War riyaan
ku riyooday, oo waxaan arkay kibis shaciir laga sameeyey
oo ku soo giringiratay xerada reer Midyaan, oo waxay soo
gaadhay teendhada, oo intay ku dhacday ayay dumisay, oo
markaasay gembiday, oo teendhadiina way dhacday. 14
Markaasaa saaxiibkiis u jawaabay oo wuxuu ku yidhi, Taasu
wax kale ma aha, seeftii Gidcoon ina Yoo'aash mooyaane,
kaasoo ah nin reer Israa'iil ah. Ilaah baa kaas gacantiisa
geliyey reer Midyaan iyo ciidanka oo dhanba. 15 Oo markii
Gidcoon maqlay sheegistii riyada iyo micnaynteediiba ayuu
Rabbiga caabuday, oo kolkaasuu xeradii reer binu Israa'iil ku
noqday, oo wuxuu ku yidhi, Kaca, waayo, Rabbigu gacantuu
idiin soo geliyey ciidanka reer Midyaan. 16 Markaasuu
saddexdii boqol oo nin u kala qaybiyey saddex guuto, oo
kulligoodba gacmahuu u geliyey buunan, iyo jalxado madhan
oo ay qoryo ololayaa ku dhex jiraan. 17 Oo wuxuu ku yidhi
iyagii, Ii fiirsada, oo yeela sidaan yeelo oo kale; oo bal eega,
markii aan gaadho meesha xerada ku wareegsan waa inaad
yeeshaan sidaan yeelo oo kale. 18 Markaan buunka afuufo,

aniga iyo inta ila jirta oo dhammu, idinkuna buunanka dhinac
walba kaga afuufa xerada, oo waxaad tidhaahdaan, Rabbiga
aawadiis iyo Gidcoon aawadiis. 19 Haddaba Gidcoon iyo
boqolkii nin oo la jiray waxay yimaadeen meeshii xerada ku
wareegsanayd, dhankii ugu fogaa, oo markaasna waxay
ahayd habeenbadhkii goorta waardiyaha cusub la saaro;
oo waxay afuufeen buunankii, jalxadihii gacmahooda ku
jirayna way burburiyeen. 20 Markaasay saddexdii guutoba
buunankii afuufeen, oo jalxadihiina way burburiyeen, oo
qoryihii ololayayna waxay ku wada qabsadeen gacanta
bidix, buunankiina gacanta midig inay afuufaan, oo waxay
ku wada qayliyeen, Seeftii Rabbiga iyo Gidcoon. 21 Oo
iyana nin waluba wuxuu istaagay meeshiisii iyagoo xerada
ku wareegsan; markaasaa ciidankii oo dhammu wada
yaacay; wayna qayliyeen oo carareen. 22 Oo iyana waxay
afuufeen saddexdii boqol oo buun, markaasaa Rabbigu
wuxuu nin walba ku kiciyey saaxiibkiis iyo ciidankii oo dhan;
oo ciidankiina wuxuu sii cararayay ilaa Beytshitah oo ah
xagga Sereeraad, iyo tan iyo xuduudka Aabeel Mehoolaah
oo u dhow Tabbaad. 23 Oo raggii reer binu Israa'iilna
waxay isaga soo urureen reer Naftaali, iyo reer Aasheer,
iyo reer Manaseh oo dhan, oo waxay eryoodeen reer
Midyaan. 24 Markaasaa Gidcoon wargeeyayaal u diray dalkii
buuraha lahaa oo reer Efrayim oo dhan, oo wuxuu ku yidhi,
Dhaadhaca, oo ka hor taga reer Midyaan, oo waxaad ka
hor qabsataan biyaha ku jira tan iyo Beytbaaraah, iyo xataa
Webi Urdun. Markaasay raggii reer Efrayim oo dhammu
soo urureen oo waxay qabsadeen biyihii ku jiray tan iyo
Beytbaaraah, iyo xataa Webi Urdun. 25 Oo waxay gacanta ku
dhigeen labadii amiir oo reer Midyaan, oo ahaa Cooreeb iyo
Se'eeb; oo markaasay Cooreeb ku dileen dhagaxii Cooreeb,
oo Se'eebna waxay ku dileen macsaraddii Se'eeb, wayna sii
eryoodeen reer Midyaan; markaasay madaxyadii Cooreeb
iyo Se'eeb Gidcoon ugu keeneen Webi Urdun shishadiisa.

**8** Oo raggii reer Efrayim waxay Gidcoon ku yidhaahdeen,
War maxaad waxan noogu samaysay, oo aad noogu
yeedhi weyday, markaad u soo kacday inaad reer Midyaan
la dagaallanto? Oo aad iyo aad bay u canaanteen isagii.
2 Oo isna wuxuu ku yidhi, Haddaba maxaan sameeyey
oo u qalma waxaad samayseen? Ururinta dambe oo
canabka reer Efrayim sow kama wanaagsana ururinta
hore oo canabka reer Abiiceser? 3 Ilaah wuxuu gacanta
idiin geliyey amiirradii reer Midyaan oo ahaa Cooreeb iyo
Se'eeb; haddaba maxaan samayn karay oo u qalma waxaad
samayseen? Oo markuu sidaas ku yidhi ayaa ciilkay u
qabeen ka baxay. 4 Markaasay Gidcoon iyo saddexdii boqol
oo nin ee la socotay isaga yimaadeen Webi Urdun, wayna
ka gudbeen, oo in kastoo ay daalanaayeen weliba wax bay
eryoonayeen. 5 Markaasuu dadkii reer Sukod ku yidhi, Waan
idin baryayaaye, dadka ila socda kibis siiya, waayo, way
daalan yihiin, oo anna waxaan eryoonayaa boqorrada reer
Midyaan oo ah Sebah iyo Salmunnac. 6 Markaasaa amiirradii
reer Sukod waxay ku yidhaahdeen, Sebah iyo Salmunnac
miyey haatan gacantaada ku jiraan aannu colkaaga cunto
siinnee? 7 Markaasaa Gidcoon wuxuu yidhi, Waa hagaag ee
markii Rabbigu ii soo gacangeliyo Sebah iyo Salmunnac
ayaan hilibkiinna ku jeexjeexi doonaa qodxanta cidlada iyo
gocondhada. 8 Markaasuu intuu halkaas ka tegey ayuu u
kacay xagga reer Fenuu'eel, sidii oo kaluu ku yidhi; oo raggii
reer Fenuu'eel waxay ugu jawaabeen sidii ay reer Sukod
ugu jawaabeen oo kale. 9 Kolkaasuu haddana wuxuu la
hadlay raggii reer Fenuu'eel oo wuxuu ku yidhi, Markaan
soo nabad noqdo ayaan dumin doonaa munaaraddan. 10
Haddaba Sebah iyo Salmunnac waxay joogeen Qarqor,
iyaga iyo ciidammadoodii, oo waxay ku dhowaayeen shan
iyo toban kun oo nin, oo intaasuna waxay ahayd intii ka
hadhay ciidankii reer bariga oo dhan; waayo, waxaa ka la'day
boqol iyo labaatan kun oo nin oo seefqaad ah. 11 Kolkaasaa
Gidcoon u kacay xagga kuwii teendhooyinka degganaa
oo ku jiray meel bari ka xigta Nobax iyo Yaagbehaah, oo
wuxuu laayay ciidankii, maxaa yeelay, ciidanku nabad buu u
fadhiyey. 12 Oo Sebah iyo Salmunnac way carareen, oo
isna wuu eryooday, wuuna soo qabsaday labadii boqor oo
reer Midyaan oo ahaa Sebah iyo Salmunnac, oo ciidankii
oo dhanna wuu ka nixiyey. 13 Oo Gidcoon ina Yoo'aash
wuxuu dagaalkii kaga soo noqday jiirtii Xeres. 14 Markaasuu
wuxuu qabtay nin dhallinyar oo reer Sukod ah, oo wax
weyddiiyey; oo isna wuxuu u tilmaamay amiirradii reer
Sukod iyo odayaashoodii, oo waxayna ahaayeen toddoba
iyo toddobaatan nin. 15 Markaasuu wuxuu u yimid raggii
reer Sukod, oo wuxuuna ku yidhi, Bal eega Sebah iyo
Salmunnac, kuwii aad daraaddood iigu majaajilooteen oo
aad igu tidhaahdeen, Sebah iyo Salmunnac miyey haatan
gacantaada ku jiraan, aannu raggaaga daalan cunto siinnee?
16 Markaasuu kaxaystay odayaashii magaalada, oo wuxuu
qaaday qodxantii cidlada iyo gocondho, wuuna ku edbiyey
dadkii reer Sukod. 17 Oo munaaraddii Fenuu'eelna wuu
dumiyey, dadkii magaaladana wuu laayay. 18 Kolkaasuu
Sebah iyo Salmunnac ku yidhi, Raggii aad Taaboor ku
layseen siday ahaayeen? Oo iyana waxay ugu jawaabeen,
Waxay ahaayeen sidaadoo kale; oo mid waluba wuxuu
u ekaa ilmo boqor oo kale. 19 Isna wuxuu yidhi, Waxay
ahaayeen walaalahay oo ah wiilashii hooyaday; oo haddii

aad iyagoo nool bixin lahaydeen, Rabbiga nool baan ku dhaartaye, idinma aan laayeen. 20 Markaasuu curadkiisii Yeter ku yidhi, Kac oo laa iyaga. Laakiinse wiilkii seeftiisii lama uu soo bixin; maxaa yeelay, wuu baqay, waayo, weli wuu yaraa. 21 Markaasaa Sebah iyo Salmunnac waxay ku yidhaahdeen, War adigu kac oo na laa; waayo, nin waluba siduu yahay ayaa xooggiisuna yahay. Markaasaa Gidcoon kacay oo laayay Sebah iyo Salmunnac, oo wuxuu qaatay bilihii ku xidhnaa qoorta awrtooda. 22 Markaasaa dadkii reer binu Israa'iil waxay Gidcoon ku yidhaahdeen, Haddaba noo tali, adiga iyo wiilkaaga, iyo wiilkaaga wiilkiisuba; maxaa yeelay, waad naga badbaadisay gacantii reer Midyaan. 23 Kolkaasaa Gidcoon wuxuu ku yidhi, Anigu idiinma talin doono, wiilkayguna idiinma talin doono; laakiinse Rabbigaa idiin talin doona. 24 Oo haddana Gidcoon wuxuu ku yidhi, Waxaan idin weyddiisan lahaa in ninkiin waluba i siiyo hilqadihii uu boolida u helay. (Waxay haysteen hilqado dahab ah, maxaa yeelay, waxay ahaayeen reer Ismaaciil). 25 Oo waxay ugu jawaabeen, Annagoo raalli ka ah ayaannu ku siinaynaa. Kolkaasay maro gogleen, oo nin kastaaba wuxuu ku tuuray hilqadihii uu boolida u helay. 26 Oo hilqadihii dahabka ahaa oo uu weyddiistay miisaankoodii wuxuu noqday kun iyo toddoba boqol oo sheqel oo dahab ah, intaasoo aanay ku jirin bilihii, iyo murriyadihii, iyo dharkii guduudnaa oo ay boqorradii reer Midyaan xidhnaayeen, iyo silsiladihii sudhnaa qoorta awrtooda. 27 Markaasaa Gidcoon wuxuu dahabkii ka sameeyey eefod, oo wuxuu dhigay magaaladiisii taasoo ahayd Coofraah; oo reer binu Israa'iil oo dhammuna way wada raaceen sidii naag ninkeedii ka dhillowday, markaasuu dabin ku noqday Gidcoon iyo reerkiisiiba. 28 Sidaasaa reer Midyaan loo hoosaysiiyey reer binu Israa'iil hortooda, oo mar dambena madaxooda kor uma ay qaadin. Oo wakhtigii Gidcoon dalku wuxuu nastay afartan sannadood. 29 Markaasaa wiilkii Yoo'aash, oo Yerubbacal ahaa intuu tegey ayuu iska degay gurigiisii. 30 Oo Gidcoon wuxuu lahaa toddobaatan wiil oo uu isagu dhalay, waayo, wuxuu qabay naago badan. 31 Oo naagtiisii addoonta ahayd oo degganayd Shekem, iyana wiil bay u dhashay, oo wuxuu magiciisii u bixiyey Abiimeleg. 32 Oo Gidcoon ina Yoo'aash ayaa dhintay isagoo da' weyn, oo waxaa lagu aasay xabaashii aabbihiis Yoo'aash, oo ku tiil Coofraah tii reer Abiiceser. 33 Oo isla markii Gidcoon dhintay ayay reer binu Israa'iil haddana noqdeen, oo Bacaliimkii raaceen sidii naag ninkeedii ka dhillowday, oo Bacal Beriidna ilaahoodii bay ka dhigteen. 34 Oo reer binu Israa'iilna ma ay xusuusan Rabbiga Ilaahood ahaa, oo ka samatabbixiyey cadaawayaashoodii dhan kasta ka xigay oo dhan; 35 raxmadna ma ay tusin reerkii Yerubbacal, kaasoo ahaa Gidcoon, siduu wanaagga oo dhan ugu sameeyey reer binu Israa'iil.

9 Markaasaa Abiimeleg ina Yerubbacal tegey xagga Shekem iyo abtiyaashiis, oo wuu la hadlay iyagii iyo reerka awowgiis oo dhan, oo wuxuu ku yidhi, 2 Waan idin baryayaaye, La hadla dadka Shekem oo dhan, oo bal weyddiiya, Kee baa idiin wanaagsan, in wiilasha Yerubbacal oo ah toddobaatan ay idiin wada taliyaan, mise in mid keliyahu idiin taliyo? Oo waxaad kaloo xusuusataan inaan ahay laftiinnii iyo hilibkiinnii. 3 Markaasay abtiyaashiis ula hadleen dadkii Shekem oo dhan, oo waxay u sheegeen erayadiisii oo dhan; kolkaasay qalbiyadoodii u leexdeen inay Abiimeleg raacaan; waayo, waxay yidhaahdeen, Isagu waa walaalkeen. 4 Markaasay waxay isagii gurigii Bacal Beriid ka siiyeen toddobaatan xabbadood oo lacag ah, oo Abiimeleg wuxuu ku kiraystay ciyaalasuuq iyo waxmatarayaal isaga raacay. 5 Markaasuu reerkii aabbihiis ugu tegey Coofraah, oo wuxuu isku dhagax dushiis ku laayay walaalihiis ilmo Yerubbacal oo ahaa toddobaatan qof; laakiinse garuddambayskii Yerubbacal oo ahaa Yootam ayaa hadhay, waayo, wuu dhuuntay. 6 Markaasaa waxaa soo shiray oo isku soo ururay dadkii Shekem oo dhan iyo reer Millo oo dhan, oo intay tageen ayay Abiimeleg boqor ka dhigteen, oo waxay ku ag boqreen geedkii tiirkii ku yiil Shekem. 7 Oo markii taas loo sheegay Yootam ayuu tegey oo wuxuu isku taagay Buur Gerisiim dusheedii, oo intuu qayliyey ayuu codkiisii kor u qaaday oo yidhi, Bal i maqla, dadka reer Shekemow, in Ilaah idin maqlo. 8 Waa baa dhirtu damacday inay boqor subkaan, markaasay geedsaytuun ku yidhaahdeen, Kaalay oo boqor noo noqo. 9 Laakiinse geedsaytuunkii wuxuu ku yidhi iyagii, Miyaan barwaaqadayda ka tagaa, tan lagu sharfa Ilaah iyo dadkaba, oo miyaan u kacaa inaan hore iyo dib uga lulmado geedaha dushooda? 10 Markaasay dhirtii ku yidhaahdeen geedberde, Kaalay oo boqor noo noqo. 11 Laakiinse geedberdihii wuxuu ku yidhi, Miyaan ka tagaa macaankayga iyo midhahayga wanaagsan, oo miyaan u kacaa inaan hore iyo dib uga lulmado geedaha dushooda? 12 Markaasay dhirtii ku yidhaahdeen geedcanab, Kaalay oo boqor noo noqo. 13 Markaasaa geedcanabkii wuxuu ku yidhi iyagii, Miyaan ka tagaa khamrigayga ka farxiya Ilaah iyo dadkaba, oo miyaan u kacaa inaan hore iyo dib uga lulmado geedaha dushooda? 14 Markaasaa dhirtii oo dhammu waxay ku yidhaahdeen gocondho, Kaalay oo boqor noo noqo. 15 Markaasaa gocondhadii waxay dhirtii ku tidhi, Haddaad daacad ii boqranaysaan, kaalaya oo

hooskayga hadhsada; haddii kalese, dab ha ka soo baxo
gocondhada oo ha laasto geedaha kedar la yidhaahdo oo
Lubnaan. 16 Haddaba haddaad daacad iyo si qumman ku
socoteen, markii aad boqrateen Abiimeleg, iyo haddaad
daacad kula macaamilooteen Yerubbacal iyo reerkiisii, oo
aad u samayseen wixii uu idinka istaahilay; 17 (waayo,
aabbahay idinkuu idiin diriray oo aawadiin buu naftiisii u
biimeeyey, oo wuxuu idinka soo samatabbixiyey gacantii reer
Midyaan; 18 oo idinku maanta waxaad ku kacdeen reerkii
aabbahay, oo waxaad isku dhagax ku layseen wiilashiisii
oo ah toddobaatan qof, oo waxaad dadkii Shekem boqor
uga dhigteen Abiimeleg oo ah wiilkii addoontiisa, maxaa
yeelay, isagu waa walaalkiin; ) 19 haddaba haddaad maanta
daacad iyo si qumman ula macaamilooteen Yerubbacal
iyo reerkiisii, de markaas Abiimeleg ku reyreeya oo isna
ha idinku reyreeyo; 20 haddii kalese, dab ha ka soo baxo
Abiimeleg, oo ha laasto dadka Shekem iyo reer Millo; oo
dadka Shekem iyo reer Millona dab ha ka soo baxo, oo ha
laasto Abiimeleg. 21 Markaasaa Yootam orday oo cararay, oo
wuxuu tegey Bi'ir, oo halkaasuu joogay cabsidii uu walaalkiis
Abiimeleg ka qabay aawadeed. 22 Oo Abiimelegna saddex
sannadood buu amiir u ahaa reer binu Israa'iil. 23 Oo
Ilaahna dadkii Shekem iyo Abiimeleg dhexdooda wuxuu u
soo diray jinni; oo dadkii Shekemna way khiyaaneeyeen
Abiimeleg, 24 in dulmigii lagu sameeyey toddobaatankii
wiil oo Yerubbacal uu yimaado, oo dhiiggoodii la saaro
walaalkood Abiimeleg oo iyaga dilay, iyo dadkii reer Shekem
oo gacmihiisa xoojiyey inuu laayo walaalihiis. 25 Oo dadkii
reer Shekemna waxay isagii buuraha dushooda u saareen
rag gaadmo ah, oo iyana waxay dhaceen wax alla wixii
jidkaas agtooda ah soo maray; oo taas waxaa loo sheegay
Abiimeleg. 26 Markaasaa Gacal ina Cebed ayaa yimid isagoo
la socda walaalihiis, oo wuxuu tegey Shekem; oo dadkii
reer Shekemna way isku halleeyeen isagii. 27 Markaasay
beeraha tageen, oo canabkoodii soo gurteen, oo waxay ku
tunteen midhihii canabka, wayna iideen, oo waxay galeen
gurigii ilaahood, oo wax bay cuneen oo cabbeen, oo waxay
caayeen Abiimeleg. 28 Markaasaa Gacal ina Cebed yidhi,
Abiimeleg waa ayo? Shekemna waa ayo? Maxaynu ugu
adeegna? Sow isagu ma aha ina Yerubbacal? Sirkaalkiisuna
sow ma aha Sebul? U adeega dadkii reer Xamoor oo
ahaa Shekem aabbihiis; laakiinse maxaynu ugu adeegnaa
isaga? 29 Haddii Ilaah dadkan gacantayda hoos gelin lahaa,
ogaada, Abiimeleg waan eryi lahaaye. Kolkaasuu ku yidhi
Abiimeleg, Ciidankaaga soo badso oo soo bax. 30 Markii
Sebul oo ahaa taliyihii magaaladu maqlay erayadii Gacal ina
Cebed ayuu aad u cadhooday. 31 Markaasuu hoos ahaan
wargeeyayaal ugu diray Abiimeleg, oo wuxuu ku yidhi, Bal
eeg, Gacal ina Cebed iyo walaalihiis ayaa Shekem yimid,
oo magaaladiina wuu kugu diray. 32 Haddaba adiga iyo
dadka kula jiraaba habeennimo soo kaca oo duurka ku soo
dhuunta. 33 Oo subaxda markay qorraxdu soo baxdo waa
inaad aroor hore soo kacdaa oo magaalada weerartaa; oo
bal eeg, markii isaga iyo dadka la jiraa ay dagaal kuugu
soo baxaan, markaasaad ku samayn doontaa sida kuu
suurtowda. 34 Markaasaa Abiimeleg iyo dadkii la jiray
oo dhammu habeennimo kaceen, oo waxay soo gaadeen
Shekem, iyagoo afar guuto ah. 35 Markaasaa Gacal ina
Cebed baxay, oo wuxuu istaagay iridda magaalada laga
soo galo; oo Abiimeleg iyo dadkii la jirayna waxay ka soo
kaceen gaadmadii. 36 Oo Gacalna markuu arkay dadkii
wuxuu Sebul ku yidhi, Bal eeg, dad baa buuraha dushooda
ka soo degaya. Sebulna wuxuu ku yidhi isagii, War waxaad
arkaysaa oo dad moodaysaa buuraha hooskooda. 37 Oo
Gacal haddana wuu hadlay oo wuxuu yidhi, Bal day, dad
baa dhulka dhexdiisa soo socda, oo guutona waxay soo ag
socotaa geedkii Mecooneniim. 38 Markaasaa Sebul wuxuu
ku yidhi isagii, Meeh afkaagii aad ku tidhi, Waa ayo Abiimeleg
oo maxaynu ugu adeegnaa? Sow kanu ma aha dadkii aad
quudhsatay? Haddaba waan ku baryayaaye, u bax oo la
dirir. 39 Oo Gacalna intuu baxay ayuu hor maray dadkii reer
Shekem, oo wuxuu la diriray Abiimeleg. 40 Oo Abiimelegna
wuu eryooday Gacal, oo isna wuu cararay, oo dad badan oo
dhaawac ah ayaa kaga dhacay tan iyo iridda magaalada laga
galo. 41 Oo Abiimelegna wuxuu degay Aruumaah, Sebulna
wuu eryay Gacal iyo walaalihiisba, oo wuu u diiday inay
Shekem degganaadaan. 42 Oo subaxdii dambe ayaa dadkii
duurka tegey oo ay Abiimeleg u sheegeen wixii dhacay.
43 Markaasuu dadkii kaxaystay, oo intuu u kala qaybiyey
saddex guuto ayuu duurka ku gaaday; markaasuu intuu wax
fiiriyey ayuu arkay dadkii magaalada ka soo baxayay oo
intuu ku kacay ayuu laayay. 44 Markaasay Abiimeleg iyo
guutooyinkii la jiray hore u soo rooreen, oo waxay istaageen
iriddii magaalada laga soo geli jiray; oo labadii guutona
waxay ku yaaceen dadkii duurka joogay oo dhan, wayna
wada laayeen. 45 Oo Abiimelegna maalintaas oo dhan
wuxuu la dirirayay magaaladii; oo wuu qabsaday magaaladii,
oo dadkii ku jirayna wuu wada laayay; oo magaaladiina wuu
dumiyey, wuxuuna ku daadiyey cusbo. 46 Oo dadkii ku jiray
munaaraddii Shekem markay taas maqleen, ayay galeen
qalcaddii ku tiil gurigii ilaahooda Beriid la odhan jiray. 47
Markaasaa Abiimeleg waxaa loo sheegay in dadkii ku jiray
munaaraddii Shekem oo dhammu ay isku urursan yihiin. 48
Markaasaa Abiimeleg wuxuu fuulay Buur Salmoon, isagii iyo

dadkii la jiray oo dhammuba; kolkaasaa Abiimeleg wuxuu
gacanta ku qabsaday faas, oo wuxuu dhirtii ka soo jaray
laan, oo intuu kor u qaatay ayuu garbaha soo saaray, oo
dadkii la jirayna wuxuu ku yidhi, Dhaqsada, oo wixii aad igu
aragteen anoo samaynaya u sameeya sidii aan u sameeyey.
49 Markaasaa dadkii nin waluba wuxuu soo jaray laantiisii, oo
waxay soo raaceen Abiimeleg, oo intay laamihii qalcaddii ku
ag tuuleen ayay haddana dab sudheen, oo sidaasay dadkii
munaaraddii Shekem joogay oo dhammu u wada le'deen; oo
waxay ahaayeen in ku dhow kun qof oo rag iyo dumarba
leh. 50 Oo haddana Abiimeleg wuxuu tegey Teebees, oo
wuxuu degay meel ka soo hor jeedda, markaasuu qabsaday.
51 Laakiinse magaalada waxaa ku dhex tiil munaarad xoog
badan. Markaasay halkaas ku carareen rag iyo dumarba,
iyo kulli wixii magaalada joogay oo dhan, oo intay isku soo
xidheen ayay kor u fuuleen munaaradda saqafkeedii. 52
Markaasaa Abiimeleg munaaraddii yimid, wuuna la diriray, oo
wuxuu u dhowaaday iridda munaaradda inuu dab ku gubo.
53 Naag baa kor dhagaxshiid kaga soo tuurtay Abiimeleg
madaxiisii, oo burburisay dhakadiisii. 54 Markaasuu haddiiba
u yeedhay ninkii dhallinyarada ahaa, oo hubka u siday,
oo wuxuu ku yidhi, War dadku yaanu i odhan, Naag baa
dishaye, seeftaada la soo bax oo i dil. Markaasaa ninkiisii
dhallinyarada ahaa seef ka mudhbixiyey, kolkaasuu dhintay.
55 Dadkii reer binu Israa'iilna markay arkeen inuu Abiimeleg
dhintay ayaa nin waluba meeshiisii tegey. 56 Oo sidaasaa
Ilaah Abiimeleg xumaantii uu aabbihiis ku sameeyey uga
jeebay, waayo, wuxuu laayay toddobaatan walaalihiis ah:
57 oo dadkii reer Shekem xumaantoodii oo dhan Ilaah baa
ka jeebay madaxoodii, oo waxaa ku soo degay habaarkii
Yootam ina Yerubbacal.

10 Markaasaa Abiimeleg dabadiis waxaa u kacay inuu reer
binu Israa'iil badbaadiyo Toolac ina Fuwaah oo ahaa
ina Doodoo, oo reer Isaakaar ahaa, oo wuxuu degganaa
Shaamiir oo ku tiil dalkii buuraha lahaa oo reer Efrayim.
2 Kaasu wuxuu reer binu Israa'iil xukumayay saddex iyo
labaatan sannadood, dabadeedna wuu dhintay, oo waxaa
lagu aasay Shaamiir. 3 Oo kaas dabadiisna waxaa kacay
Yaa'iir oo reer Gilecaad ahaa, oo isna wuxuu reer binu
Israa'iil xukumayay laba iyo labaatan sannadood. 4 Oo
isna wuxuu lahaa soddon wiil oo soddon qayl dameer fuuli
jirtay, oo iyana waxay lahaayeen soddon magaalo, oo ilaa
maantadan la joogo la yidhaahdo Hawood Yaa'iir, oo waxay
ku yaalliin dalka Gilecaad. 5 Markaasaa Yaa'iir dhintay,
oo waxaa lagu aasay Qaamoon. 6 Markaasaa reer binu
Israa'iil waxay haddana sameeyeen wax Rabbiga hortiisa
ku xun, oo waxay u adeegeen Bacaliim, iyo Cashtarod,
iyo ilaahyadii Suuriya, iyo ilaahyadii Siidoon, iyo ilaahyadii
Moo'aab, iyo ilaahyadii reer Cammoon, iyo ilaahyadii reer
Falastiin, oo Rabbiga way ka tageen, umana ay adeegin. 7
Oo Rabbiguna aad buu ugu cadhooday reer binu Israa'iil,
markaasuu iyagii ka iibiyey gacantii reer Falastiin, iyo gacantii
reer Cammoon. 8 Oo sannaddaas way dhibeen oo dulmeen
reer binu Israa'iil; oo siddeed iyo toban sannadood ayay
dulmayeen kulli reer binu Israa'iilkii degganaa dalka reer
Amor oo ku yaal Gilecaad Webi Urdun shishadiisa. 9
Markaasay reer Cammoon ka soo gudbeen Webi Urdun
inay la diriraan reer Yahuudah, iyo reer Benyaamiin, iyo reer
Efrayim; sidaas daraaddeed reer binu Israa'iil waxay ku jireen
cidhiidhi weyn. 10 Markaasay reer binu Israa'iil Rabbiga u
qayshadeen, oo yidhaahdeen, Waannu kugu dembaabnay,
maxaa yeelay, waxaannu ka tagnay Ilaahayo, oo Bacaliimkii
baannu u adeegnay. 11 Markaasaa Rabbigu wuxuu reer
binu Israa'iil ku yidhi, Miyaanan idinka badbaadin Masriyiintii,
iyo reer Amor, iyo reer Cammoon, iyo reer Falastiin? 12 Oo
weliba reer Siidoon, iyo reer Camaaleq, iyo reer Maacoonba
way idin dulmeen, oo waad ii qayshateen, oo markaasaan
idinka badbaadiyey gacantoodii. 13 Oo weliba waad iga
tagteen, oo waxaad u adeegteen ilaahyo kale; sidaas darteed
anigu mar dambe idinma badbaadin doono. 14 Haddaba
taga oo u qayshada ilaahyadii aad doorateen; oo iyagu
ha idin badbaadiyeen wakhtiga aad cidhiidhi ku jirtaan. 15
Markaasaa reer binu Israa'iil waxay Rabbiga ku yidhaahdeen,
Waannu dembaabnay; haddaba nagu samee wax alla wixii
kula wanaagsan; laakiinse waannu ku baryaynaaye, bal
maanta na samatabbixi. 16 Markaasay iska wada fogeeyeen
ilaahyadii qalaad oo dhexdooda yiil, oo waxay u adeegeen
Rabbiga; oo naftiisuna way ka xumaatay hooggii haystay
reer binu Israa'iil. 17 Markaasaa waxaa soo wada ururay
reer Cammoon oo waxay soo degeen Gilecaad. Oo reer
binu Israa'iilna way isa soo urursadeen oo iyana waxay soo
degeen Misfaah. 18 Markaasaa dadkii iyo amiirradii reer
Gilecaad ayaa midba midka kale wuxuu ku yidhi, Car, ninkee
baa bilaabaya inuu la diriro reer Cammoon? Kaasu wuxuu
ahaan doonaa madaxda dadka Gilecaad deggan oo dhan.

11 Haddaba Yeftaah oo reer Gilecaad ahaa wuxuu ahaa nin
xoog leh, oo wuxuuna ahaa dhillo wiilkeed. Yeftaahna
waxaa dhalay Gilecaad. 2 Oo Gilecaad naagtiisiina wiilal
bay u dhashay, oo wiilashii naagtiisuna markay koreen ayay
Yeftaah iska eryeen, oo waxay ku yidhaahdeen, Reerka
aabbeheen adigu nala dhaxli maysid; maxaa yeelay, naag
kalaa ku dhashay. 3 Markaasuu Yeftaah walaalihiis ka

cararay, oo wuxuu degay dalkii Toob: markaasaa waxaa isku
soo ururay ciyaalasuuq, oo iyana waxay raaceen Yeftaah. 4
Oo intii wakhti ah dabadeed ayay reer Cammoon la dirireen
reer binu Israa'iil. 5 Oo markii reer Cammoon ay la dirireen
reer binu Israa'iil ayaa odayaashii reer Gilecaad Yeftaah ka
dooneen dalkii Toob; 6 oo waxay Yeftaah ku yidhaahdeen,
Kaalay oo madax noo noqo, aynu reer Cammoon la dirirnee.
7 Markaasuu Yeftaah odayaashii reer Gilecaad ku yidhi,
War sow ima aydnaan nebcayn oo igama aydnaan eryin
reerkii aabbahay? Maxaad haatan iigu timaadeen idinkoo
cidhiidhi ku jira? 8 Oo odayaashii reer Gilecaadna waxay ku
yidhaahdeen Yeftaah, War haatan waannu kuu soo noqonnay
si aad noo raacdid oo aad ula dirirtid reer Cammoon, oo
madax ayaad noo noqonaysaa oo waxaad ugu sarraynaysaa
dadka deggan dalka Gilecaad oo dhan. 9 Markaasuu
Yeftaah ku yidhi odayaashii reer Gilecaad, Haddaad mar
kale dalkii iigu celisaan inaan reer Cammoon la diriro, oo
Rabbigu iyaga gacanta ii soo geliyo, de markaas madax
ma idiin noqonayaa? 10 Oo odayaashii reer Gilecaadna
waxay Yeftaah ku yidhaahdeen, Taas Rabbigu ha ka noqdo
marag inoo dhexaya; oo hubaal waxaannu yeelaynaa siduu
eraygaagu yahay. 11 Markaasuu Yeftaah raacay odayaashii
reer Gilecaad oo dadkiina waxay isagii ka dhigteen madax
iyo ugaas iyaga ka sarreeya; oo Yeftaah wuxuu hadalkiisii
oo dhan Rabbiga ugu sheegay Misfaah. 12 Markaasuu
Yeftaah wargeeyayaal u diray boqorkii reer Cammoon, oo
wuxuu ku yidhi, War maxaa inaga dhexeeya, oo maxaad
iigu timid oo aad dalkayga iigu la diriraysaa? 13 Markaasuu
boqorkii reer Cammoon ku yidhi wargeeyayaashii Yeftaah
ka yimid, Maxaa yeelay, reer binu Israa'iil markii ay ka
yimaadeen Masar, waxay iga dhaceen dalkaygii ilaa Arnoon
iyo tan iyo xataa Yabboq, iyo ilaa Urdun; haddaba dalalkaas
oo dhan nabad iigu soo celi. 14 Oo Yeftaah haddana
wargeeyayaal buu u diray boqorkii reer Cammoon; 15 oo
wuxuu ku yidhi, Yeftaah wuxuu leeyahay, Reer binu Israa'iil
ma dhicin dalkii reer Moo'aab iyo dalkii reer Cammoon
toona: 16 laakiinse markii ay ka yimaadeen Masar, reer
binu Israa'iil waxay soo mareen cidlada ilaa xagga Badda
Cas, oo dabadeedna waxay yimaadeen Qaadeesh; 17
markaasaa reer binu Israa'iil waxay wargeeyayaal u direen
boqorkii reer Edom, oo waxay ku yidhaahdeen, Waannu
ku baryaynaaye, aannu dalkaaga dhex marno; laakiinse
boqorkii reer Edom ma uu dhegaysan. Sidaas oo kalena
waxay cid u direen boqorkii reer Moo'aab; laakiinse isna
wuu diiday; oo reer binu Israa'iilna waxay iska joogeen
Qaadeesh. 18 Markaasay dhex mareen cidladii, oo waxay
hareereeyeen dalkii reer Edom, iyo dalkii reer Moo'aab, oo
waxay yimaadeen geesta bari oo dalka reer Moo'aab, oo
waxay degeen Arnoon geesteeda kale; laakiinse soohdintii
reer Moo'aab sooma ay gelin, waayo, Arnoon waxay ahayd
soohdintii dalka reer Moo'aab. 19 Markaasay reer binu
Israa'iil wargeeyayaal u direen boqorkii reer Amor oo Siixon
ahaa oo boqor u ahaa Xeshboon; oo reer binu Israa'iil waxay
ku yidhaahdeen Siixon, Waannu ku baryaynaaye, aannu
dalkaaga dhex marno si aannu ugu gudubno meeshayadii.
20 Laakiinse Siixon ma aaminin reer binu Israa'iil inay dhex
maraan dalkiisii; laakiinse Siixon wuxuu soo urursaday
dadkiisii oo dhan, oo intuu Yahas soo degay ayuu reer binu
Israa'iil la diriray. 21 Markaasuu Rabbiga ah Ilaaha reer
binu Israa'iil Siixon iyo dadkiisii oo dhanba ku riday gacantii
reer binu Israa'iil oo iyana way laayeen iyagii; oo sidaasay
reer binu Israa'iil ku hantiyeen dalkii reer Amor oo dhan
iyo dadkii waddankaasba. 22 Oo waxay hantiyeen dalkii
reer Amor oo dhan tan iyo Arnoon iyo ilaa Yabboq, iyo
tan iyo cidlada iyo ilaa Webi Urdun. 23 Haddaba haatan
inta Rabbiga ah Ilaaha reer binu Israa'iil reer Amor dalka
kaga qaaday dadkiisa reer binu Israa'iil hortooda, miyaad
adigu qabsanaysaa iyaga? 24 Sow lahaan maysid wuxuu
ilaahaaga Kemoosh ahu ku siiyo inaad lahaatid? Taas
aawadeed kuwa Rabbiga Ilaahayaga ahu hortayada ka
eryo waannu qabsan doonnaa. 25 Haddaba miyaad ka
wanaagsan tahay boqorkii reer Moo'aab oo ahaa Baalaaq ina
Sifoor? Miyuu weligiis la diriray reer binu Israa'iil, oo miyuu
weligiis la dagaallamay reer binu Israa'iil? 26 Oo intii reer binu
Israa'iil ay degganaayeen Xeshboon iyo magaalooyinkeedii,
iyo Carooceer iyo magaalooyinkeedii, iyo magaalooyinkii
Arnoon dhinaceeda ku yiil oo dhan, intaasu waxay ahayd
saddex boqol oo sannadood ee maxaad wakhtigaas u soo
qabsan weydeen? 27 Sidaas daraaddeed anigu kuguma aan
dembaabin, laakiinse adigu qalad baad igu samaynaysaa
inaad ila dirirto. Rabbiga xaakinka ahu maanta ha noqdo
xaakin u dhexeeya reer binu Israa'iil iyo reer Cammoon. 28
Habase yeeshee, boqorkii reer Cammoon ma uu dhegaysan
erayadii Yeftaah u soo diray. 29 Markaasaa Ruuxii Rabbigu
wuxuu ku soo degay Yeftaah, oo wuxuu soo dhaafay reer
Gilecaad iyo reer Manaseh, oo wuxuu soo dhaafay Misfaah
tii reer Gilecaad, oo markaasuu Misfaah tii reer Gilecaadna
wuxuu uga sii gudbay xagga reer Cammoon. 30 Markaasaa
Yeftaah wuxuu Rabbiga u nidray nidar, oo wuxuu yidhi,
Hubaal haddaad reer Cammoon gacantayda soo geliso, 31
markaasaa wax alla wixii irdaha gurigayga ka soo baxo inuu
ila kulmo markaan reer Cammoon nabad kaga soo noqdo,
waxaa lahaan doona Rabbiga, oo waxaan u bixin doonaa
allabari la gubo. 32 Markaasuu Yeftaah u gudbay xagga reer

Cammoon inuu la dagaallamo, oo Rabbiguna gacantiisuu
soo geliyey. 33 Oo wuxuu iyagii laayay ilaa Carooceer
iyo tan iyo ilaa aad Minniid timaadid, oo intaasu waxay
ahaayeen labaatan magaalo, oo ilaa Aabeel Keraamiimna
wuxuu ku laayay dad badan. Sidaasaa reer Cammoon loogu
hoosaysiiyey reer binu Israa'iil hortooda. 34 Markaasuu
Yeftaah yimid Misfaah xagga gurigiisii, oo bal eeg, gabadhiisii
baa ka soo baxday inay la kulanto, iyadoo daf tumaysa oo
cayaaraysa. Madi bay u ahayd oo iyada mooyaane wiil iyo
gabadh midna ma uu lahayn. 35 Oo markuu arkay iyadii
ayuu dharkiisii iska jeexjeexay, oo wuxuu yidhi, Hoogay
gabadhaydiiyey! Hoos baad ii dhigtay, oo waxaad tahay
kuwa i dhiba middood; waayo, Rabbigaan afkayga u furay,
oo dibna uma aan noqon karo. 36 Oo waxay ku tidhi,
Aabbahayow, Rabbigaad afkaaga u furtay, haddaba igu
samee wixii afkaaga ka soo baxay, waayo, Rabbigu waa
kaaga aarguday cadaawayaashaadii, kuwaasoo ahaa reer
Cammoon. 37 Oo waxay aabbaheed ku tidhi, Bal waxan ha
la ii sameeyo, intii laba bilood ah i daa, oo intaan buuraha
tago, aniga iyo saaxiibadahay, aan bikradnimadayda u
baroortee. 38 Markaasuu yidhi, Tag. Oo intii laba bilood ah
ayuu iska diray; oo iyadii iyo saaxiibadaheedba way tageen,
oo bikradnimadeedii ayay buuraha ugu soo baroorteen. 39
Oo labadii bilood dabadeed ayay ku soo noqotay aabbaheed,
oo isna wuxuu ku sameeyey sidii uu nidarka ku galay; oo
iyana nin ma ay aqoon. Oo reer binu Israa'iilna waxaa caado
u ahaa, 40 inay gabdhaha reer binu Israa'iil sannad walba
afar maalmood baxaan oo u baroortaan gabadhii Yeftaah kii
reer Gilecaad.

**12** Oo raggii reer Efrayimna way is-urursadeen, oo waxay
u gudbeen xagga woqooyi, oo waxay Yeftaah ku
yidhaahdeen, Reer Cammoon inaad la dirirto intaad u soo
gudubtay, maxaad noogu yeedhi weyday aannu ku raacnee?
Gurigaagaannu kugu dul gubi doonnaa. 2 Yeftaahna wuxuu
ku yidhi, Aniga iyo dadkayguba dagaal weyn baannu kula
jirnay reer Cammoon, oo markaan idiin yeedhay igama
aydnaan badbaadin gacantoodii. 3 Oo markaan arkay
inaydnaan i badbaadinayn ayaan naftayda biimeeyey, oo
waxaan u gudbay reer Cammoon, oo Rabbigu gacantayduu
soo geliyey. Haddaba maxaad maanta iigu timaadeen inaad
ila dirirtaan? 4 Markaasuu Yeftaah soo urursaday raggii
reer Gilecaad oo dhan, oo wuxuu la diriray reer Efrayim; oo
reer Gilecaadna way laayeen reer Efrayim, maxaa yeelay,
waxay yidhaahdeen, Idinku fakad baad tihiin kuwiinnan reer
Gilecaad oo ku dhex jira reer Efrayim iyo reer Manaseh. 5
Oo reer Gilecaadna waxay qabsadeen meelihii Webi Urdun
laga gudbi jiray oo xagga reer Efrayim ahaa; oo markuu mid
reer Efrayim ah oo cararay yidhaahdo, I daaya aan gudbee,
waxaa dhici jirtay inay reer Gilecaad ku odhan jireen, Ma
reer Efrayim baad tahay? Oo hadduu yidhaahdo, Maya, 6
waxay ku odhan jireen, Bal waxaad tidhaahdaa Shibboled,
markaasuu odhan jiray, Sibboled, waayo, taas odhaahdeeda
qummaati uma uu odhan karin; markaasay intay qabsadaan
ku dili jireen meelihii Webi Urdun laga gudbi jiray; oo
wakhtigaas waxaa reer Efrayim ka dhintay laba iyo afartan
kun. 7 Oo Yeftaahna wuxuu reer binu Israa'iil xukumayay
lix sannadood. Markaasuu Yeftaah oo ahaa reer Gilecaad
dhintay, oo waxaa lagu aasay magaalooyinkii reer Gilecaad
middood. 8 Isaga dabadiisna waxaa reer binu Israa'iil xukumi
jiray Ibsaan oo ahaa reer Beytlaxam. 9 Oo wuxuu lahaa
soddon wiil, oo soddon gabdhoodna wuu bixiyey, soddon
gabdhoodna wiilashiisuu dibadda uga keenay. Oo isna reer
binu Israa'iil wuxuu xukumayay toddoba sannadood. 10
Markaasuu Ibsaan dhintay, oo waxaa lagu aasay Beytlaxam.
11 Dabadiisna waxaa reer binu Israa'iil xukumi jiray Eeloon oo
ahaa reer Sebulun; oo isna wuxuu reer Israa'iil xukumayay
toban sannadood. 12 Oo Eeloon oo reer Sebulun ahaana
wuu dhintay, oo waxaa lagu aasay Ayaaloon oo ku taal dalka
reer Sebulun. 13 Isaga dabadiisna waxaa reer binu Israa'iil
xukumi jiray Cabdoon ina Hilleel oo ahaa reer Fircaatoon. 14
Oo isna wuxuu lahaa afartan wiil iyo soddon uu awowe u
ahaa, oo fuuli jiray toddobaatan qayl dameer. Oo wuxuu
reer binu Israa'iil xukumayay siddeed sannadood. 15 Oo
Cabdoon ina Hilleel oo ahaa reer Fircaatoon wuu dhintay, oo
waxaa lagu aasay Fircaatoon oo ku taal dalka reer Efrayim,
kaasoo ahaa dalka buuraha leh oo reer Camaaleq.

**13** Reer binu Israa'iilna waxay haddana sameeyeen wax
Rabbiga hortiisa ku xun, markaasaa Rabbigu gacanta u
geliyey reer Falastiin intii afartan sannadood ah. 2 Oo waxaa
jiray nin reer Sorcaah ah, oo jilibkiisuna ahaa reer Daan,
magiciisana waxaa la odhan jiray Maanoo'ax, oo naagtiisuna
madhalays bay ahayd, oo ma ay dhali jirin. 3 Markaasay
malaa'igtii Rabbigu naagtii u muuqatay, oo ku tidhi, Bal
eeg, haatan waxaad tahay madhalays, oo waxba ma aad
dhashid; laakiinse waad uuraysan doontaa, oo waxaad dhali
doontaa wiil. 4 Haddaba sidaas daraaddeed iska jir, oo waan
ku baryayaaye ha cabbin khamri ama wax kale oo lagu
sakhraamo, oo wax aan nadiif ahaynna ha cunin; 5 waayo,
bal eeg, waad uuraysan doontaa, oo waxaad dhali doontaa
wiil, oo madaxiisana waa inaan mandiil la marin; waayo
ilmuhu markuu dhasho iyo inta ka dambaysaba wuxuu noqon
doonaa Nadiir Ilaah loo soocay; oo isagu wuxuu bilaabi

doonaa inuu reer binu Israa'iil ka badbaadiyo gacanta reer
Falastiin. 6 Markaasaa naagtii timid oo ninkeedii u sheegtay,
oo ku tidhi, Nin Ilaah baa ii yimid, jaahiisuna wuxuu u ekaa
jaahii malaa'igta Ilaah oo aad looga cabsado. Anna ma aan
weyddiin meeshuu ka yimid, isna iima uu sheegin magiciisa;
7 laakiinse wuxuu igu yidhi, Bal eeg, waad uuraysan doontaa,
oo waxaad dhali doontaa wiil; oo haddaba ha cabbin khamri
ama wax kale oo lagu sakhraamo; wax aan nadiif ahaynna
ha cunin; waayo, ilmuhu markuu dhasho iyo ilaa maalinta
dhimashadiisa wuxuu noqon doonaa Nadiir Ilaah loo soocay.
8 Markaasuu Maanoo'ax Rabbiga baryay oo yidhi, Sayidow,
waan ku baryayaaye, ninkii Ilaah oo aad soo dirtay, mar kale
ha noo yimaado, oo ha na baro waxa aannu ku samayn
lahayn wiilka dhalan doona. 9 Ilaahna codkii Maanoo'ax
wuu maqlay, oo malaa'igtii Ilaahna naagtii bay mar kale
u timid iyadoo berrinka fadhida; laakiinse Maanoo'ax oo
ahaa ninkeedii lama uu joogin iyada. 10 Markaasay naagtii
dhaqsatay oo orodday, oo ninkeeday u sheegtay, oo waxay
ku tidhi, Bal eeg, waxaa ii muuqday ninkii maalintii ii yimid.
11 Markaasuu Maanoo'ax kacay, oo naagtiisii raacay, oo
wuxuu u yimid ninkii, kolkaasuu ku yidhi, Ma waxaad tahay
ninkii la hadlay naagta? Oo isna wuxuu yidhi, Waan ahay. 12
Markaasuu Maanoo'ax yidhi, Haddaba markii sidaad tidhi ay
rumowdo, wiilku caynkee buu noqon doonaa, shuqulkiisuna
muxuu ahaan doonaa? 13 Markaasay malaa'igtii Rabbigu
Maanoo'ax ku tidhi, Kulli wixii aan u sheegay oo dhan
naagtu ha iska jirto. 14 Iyadu waa inaanay cunin wax
ka soo baxa geedcanab, oo yaanay cabbin khamri ama
wax kale oo lagu sakhraamo, oo wax aan nadiif ahaynna
yaanay cunin; oo kulli wixii aan ku amray oo dhan ha
dhawrto. 15 Maanoo'axna wuxuu malaa'igtii Rabbiga ku
yidhi, Waan ku baryayaaye, aan ku raajinno intii aannu orgi
yar kuu diyaarinayno. 16 Oo malaa'igtii Rabbiguna waxay
Maanoo'ax ku tidhi, In kastoo aad i raajiso, anigu cuni maayo
cuntadaada; oo haddaad diyaarisid allabari la gubo, waa
inaad Rabbiga u bixisid. Waayo, Maanoo'ax ma uu ogayn
inay malaa'igtii Rabbiga tahay. 17 Markaasuu Maanoo'ax
malaa'igtii Rabbiga ku yidhi, Magacaa, si markay erayadaadu
ahaadaan, aannu kuu murwayno? 18 Malaa'igtii Rabbiguna
waxay ku tidhi, Maxaad magacayga u haybsanaysaa, waaba
yaabe? 19 Sidaas daraaddeed Maanoo'ax wuxuu qaaday
orgigii yaraa iyo qurbaankii hadhuudhka ahaa, oo dhagax
dushiis buu Rabbiga ugu bixiyey; oo malaa'igtiina yaab
bay samaysay, Maanoo'ax iyo afadiisiina way fiiriyeen. 20
Waayo, markii ololkii meesha allabariga ka kacay xagga
samada, ayay malaa'igtii Rabbigu kor u raacday ololkii
meesha allabariga; Maanoo'ax iyo afadiisiina way fiiriyeen;
oo intay dhaceen ayay wejigoodii dhulka saareen. 21
Laakiinse malaa'igtii Rabbigu mar dambe uma ay muuqan
Maanoo'ax iyo afadiisii. Markaasaa Maanoo'ax ogaaday
inay ahayd malaa'igtii Rabbiga. 22 Oo Maanoo'axna wuxuu
afadiisii ku yidhi, Hubaal waynu dhimanaynaa, maxaa yeelay,
waxaynu aragnay Ilaah. 23 Laakiinse afadiisii waxay ku
tidhi, Hadduu Rabbigu doonayo inuu ina dilo, inagama uu
aqbaleen qurbaan la gubo iyo qurbaan hadhuudh ah, oo
waxyaalahan oo dhanna inama uu tuseen, oo haatanna
inooma uu sheegeen waxyaalo caynkan ah. 24 Oo naagtiina
wiil bay dhashay, oo magiciisiina waxay u bixisay Samsoon;
wiilkiina wuu koray, Ilaahna wuu barakeeyey isagii. 25
Oo Ruuxii Rabbiguna wuxuu bilaabay inuu ku dhaqaajiyo
Maxaneh Daan, oo u dhexaysa Sorcaah iyo Eshtaa'ool.

**14** Markaasuu Samsoon tegey Timnaad, oo wuxuu ku
arkay naag ka mid ah gabdhaha reer Falastiin. 2 Oo
intuu soo noqday ayuu aabbihiis iyo hooyadiis u sheegay; oo
wuxuu ku yidhi, Waxaan Timnaad ku arkay naag gabdhaha
reer Falastiin ka mid ah, haddaba sidaas daraaddeed taas ii
doona aan guursadee. 3 Markaasay aabbihiis iyo hooyadiis
ku yidhaahdeen, War miyaan naagu ku jirin gabdhaha tolkaa,
amase dadkayga oo dhan, oo maxaa kugu wata inaad
ka guursato reer Falastiinka buuryoqabka ah? Markaasuu
Samsoon aabbihiis ku yidhi, Iyada ii doon, waayo, aad bay
iila wanaagsan tahay. 4 Laakiinse aabbihiis iyo hooyadiis ma
ay ogayn in taasu ahayd wax Rabbiga ka yimid; waayo,
wuxuu doonayay sabab uu ku qabsado reer Falastiin. Oo
wakhtigaas reer Falastiin ayaa xukumay reer binu Israa'iil. 5
Markaasaa Samsoon, iyo aabbihiis iyo hooyadiis, waxay
tageen Timnaad, oo waxay yimaadeen beerihii canabka
ahaa oo Timnaad. Oo bal eeg, waxaa isagii ku soo ciyey
libaax yar. 6 Markaasaa Ruuxii Rabbigu aad ugu soo degay
isagii, oo Samsoon wuxuu u jeexjeexay libaaxii sidii uu
orgi yar u kala jeexjeexi lahaa oo kale, oo gacmihiisana
waxba kuma uu haysan; laakiinse wixii uu sameeyey uma
uu sheegin aabbihiis iyo hooyadiis toona. 7 Markaasuu
dhaadhacay oo naagtii la hadlay; oo iyana Samsoon aad
bay ula wanaagsanayd. 8 Oo wakhti yar dabadeed ayuu u
soo noqday inuu kaxaysto iyadii, markaasuu ku leexday
inuu arko bakhtigii libaaxa; oo bal eeg, bakhtigii libaaxa
waxaa ku jiray shinni badan iyo malab. 9 Oo markaasuu
gacmihiisii ku qaaday, oo iska tegey, isagoo cunaya intuu
sii socday, markaasuu u yimid aabbihiis iyo hooyadiis, oo
iyagiina wuu siiyey, wayna cuneen; laakiinse iyagii uma uu
sheegin inuu malabka ka soo qaaday bakhtigii libaaxa. 10
Markaasuu aabbihiis dhaadhacay oo u yimid naagtii; oo
Samsoon halkaasuu diyaafad ku sameeyey; waayo, ragga

dhallinyarada ahu sidaasay yeeli jireen. 11 Oo markay isagii
arkeen ayay u keeneen soddon nin si ay ula joogaan. 12
Kolkaasuu Samsoon iyagii ku yidhi, Bal aan idin halxidho.
Toddobada maalmood oo diyaafadda ah haddaad ii sheegi
kartaan oo aad furi kartaan, waxaan idin siinayaa soddon
maro, iyo soddon isku joog oo dhar ah; 13 laakiinse haddaad
ii sheegi weydaan, idinku waa inaad i siisaan soddon maro
iyo soddon isku joog oo dhar ah. Oo iyana waxay ku
yidhaahdeen, Bal sheeg halxidhkaaga, aannu maqalnee.
14 Markaasuu ku yidhi iyagii, Kii wax cuni jiray ayaa cunto
ka soo baxday, Kii xoogga badnaana waxaa ka soo baxay
macaan. Oo iyana intii saddex maalmood ah ayay halxidhkii
furi waayeen. 15 Oo maalintii toddobaad waxay Samsoon
naagtiisii ku yidhaahdeen, Soo sasab ninkaaga si uu noogu
sheego halxidhkii, yaannan adiga iyo reerka aabbahaaba
dab ku gubine. Ma waxaad noogu yeedheen inaad na
caydhaysaan? Sow sidaas ma aha? 16 Markaasay Samsoon
naagtiisu ku hor ooyday, oo waxay isagii ku tidhi, Waxba
iima aad samayn nacayb maahee, oo ima aad jeclid innaba.
Dadkaygii waad halxidhay, oo iima aad sheegin. Markaasuu
ku yidhi, Aabbahay iyo hooyaday toona uma aan sheegine,
ma adaan kuu sheegayaa? 17 Oo toddobadii maalmoodba
way ku hor ooyaysay isaga, intii ay diyaafaddoodii ka
dhammaanaysay; oo waxaa dhacay maalintii toddobaad inuu
iyadii u sheegay, maxaa yeelay, aad bay ugu cadaadisay;
markaasay halxidhkii micnihiisii dadkeedii u sheegtay. 18
Markaasay dadkii magaaladu isagii ku yidhaahdeen maalintii
toddobaad intaan qorraxdu dhicin, Maxaa malab ka macaan?
Maxaase libaax ka xoog badan? Markaasuu iyagii ku yidhi,
Haddaydnan qaalintayda beerta ku falin, Halxidhkayga ma
aydnaan furteen. 19 Markaasuu Ruuxii Rabbigu aad ugu
soo degay isaga, oo wuxuu tegey Ashqeloon, wuxuuna ka
laayay soddon nin, oo intuu soo furtay ayuu dharkii siiyey
kuwii halxidhkii furay. Oo markaasuu intuu aad u cadhooday
ayuu reerkii aabbihiis tegey. 20 Laakiinse naagtii Samsoon
waxaa la siiyey wehelkiis oo uu saaxiib ka dhigan jiray.

**15** Laakiinse wakhti yar dabadeed ayuu Samsoon xilligii
sarreenka la goosan jiray soo booqday naagtiisii, isagoo
orgi yar wada. Markaasuu yidhi, Naagtayda waxaan ugu
tegayaa qowladda. Laakiinse aabbeheed uma uu oggolaanin
inuu u tago. 2 Oo aabbeheedna wuxuu yidhi, Sida runta ah
waxaan mooday inaad nacday iyada, sidaas daraaddeed
waxaan siiyey saaxiibkaa. Walaasheeda ka yari sow kama
qurux badna? Haddaba waan ku baryayaaye, meesheedii ka
qaado iyada. 3 Markaasuu Samsoon iyagii ku yidhi, Markan
anigu eed kuma lahaan doono markaan belaayo ku sameeyo
reer Falastiin. 4 Markaasuu Samsoon tegey, oo wuxuu
soo qabsaday saddex boqol oo dawaco, oo intuu qoryo
soo qaaday ayuu dabooyinka isugu xidhay, oo qoryihiina
wuxuu ku dhex xidhay laba dabo oo kasta. 5 Oo markuu
qoryihii dab ku dhejiyey dabadeed ayuu dawacooyinkii ku
sii dhex daayay beerihii sarreenka ahaa oo reer Falastiin,
markaasaa waxaa gubtay sarreenkii beeraha dhex tuulnaa
iyo kii weli taagnaa, iyo weliba beerihii saytuunka ahaa.
6 Markaasay reer Falastiin yidhaahdeen, Yaa waxakan
sameeyey? Kolkaasay yidhaahdeen, Waxaa sameeyey
Samsoon oo ah wiilka uu kan reer Timnaad soddogga u
yahay, maxaa yeelay, isagu wuxuu ka qaaday naagtiisii, oo
wuxuu siiyey saaxiibkiis. Kolkaasay reer Falastiin yimaadeen
oo iyadii iyo aabbeheedba dab bay ku gubeen. 7 Kolkaasuu
Samsoon iyagii ku yidhi, Haddaad sidatan yeeshaan, hubaal
waan idinka aargudan doonaa, oo dabadeedna waan joogsan
doonaa. 8 Markaasuu aad iyo aad u laayay, dabadeedna
intuu dhaadhacay ayuu degay dillaacii dhagaxa weyn oo
Ceetaam. 9 Markaasay reer Falastiin intay tageen degeen
dhulka Yahuudah, oo waxay ku dhex firdheen Lexii. 10
Oo markaasay raggii reer Yahuudah ku yidhaahdeen,
War maxaad noogu soo duusheen? Oo iyana waxay ku
yidhaahdeen, Waxaannu u nimid inaannu Samsoon soo
xidhno oo ku samayno wixii uu nagu sameeyey oo kale.
11 Markaasaa dillaacii dhagaxa weyn oo Ceetaam waxaa
ku dhaadhacay saddex kun oo nin oo reer Yahuudah ah,
oo waxay Samsoon ku yidhaahdeen, War miyaanad ogayn
inay reer Falastiin inoo taliyaan? Oo haddaba waa maxay
waxakan aad nagu samaysay? Oo isna wuxuu ku yidhi,
Wixii ay igu sameeyeen oo kale ayaan anna ku sameeyey
iyaga. 12 Markaasay isagii ku yidhaahdeen, Waxaannu u
nimid inaannu ku xidhno, si aannu gacanta kuugu gelinno
reer Falastiin. Kolkaasuu Samsoon ku yidhi iyagii, Ii dhaarta
inaydnaan idinku i dilayn. 13 Oo intay la hadleen ayay ku
yidhaahdeen, Maya; laakiinse aad baannu kuu xidhaynaa oo
gacantoodaannu ku gelinaynaa; laakiinse hubaal annagu
ku dili mayno. Markaasay laba xadhig oo cusub ku soo
xidheen, oo intay dhagaxii weynaa ka soo bixiyeen ayay
kor u kexeeyeen. 14 Oo markuu Lexii yimid ayay reer
Falastiin qayliyeen intay ka hor yimaadeen. Markaasuu
Ruuxii Rabbigu aad ugu soo degay isagii, oo xadhkihii
gacmihiisa ku xidhnaa waxay noqdeen sidii geed linen ah oo
dab lagu gubay, birihiina way ka dhaceen gacmihiisii. 15
Markaasuu helay daan dameer oo cusub, oo intuu gacantiisii
fidiyey ayuu ku qaatay, oo wuxuu daankii ku laayay kun nin.
16 Oo Samsoonna wuxuu yidhi, Dameer daankiis ayaan
taallo taallo ku dul dhigay, Oo dameer daankiis ayaan kun nin

ku laayay. 17 Oo markuu hadalkii dhammeeyey ayuu daankii iska xooray, oo meeshaasna waxaa loo bixiyey Raamad Lexii. 18 Oo markaasuu aad u oomay, oo Rabbiguu baryay, oo wuxuu yidhi, Adaa samatabbixintan weyn gacantayda siiyey, anoo addoonkaaga ah, de haddaba ma waxaan u dhimanayaa oon, oo ma waxaan gelayaa gacanta kuwa buuryoqabka ah? 19 Markaasaa Ilaah wuxuu kala dillaaciyey meeshii qodnayd oo Lexii ku tiil, oo waxaa ka soo baxay biyo, oo markuu cabbay ayaa naftiisii soo noqotay, wuuna noolaaday. Taas aawadeed meeshaas magaceedii waxaa loo bixiyey Ceyn Haqooree, oo xataa maanta waxay ku taal Lexii. 20 Oo isna wakhtigii reer Falastiin wuxuu reer binu Israa'iil xukumayay labaatan sannadood.

**16** Markaasuu Samsoon tegey Gaasa, oo halkaas wuxuu ku arkay dhillo, wuuna u galay. 2 Oo waxaa dadkii reer Gaasa lagu yidhi, Samsoon halkanuu yimid. Oo intay hareereeyeen ayay habeenkii oo dhan magaalada iriddeeda ku gaadayeen, oo habeenkaas oo dhanna way aamusnaayeen, oo waxay yidhaahdeen, Markuu waagu beryo ayaynu dili doonnaa. 3 Oo Samsoonna ilaa habeenbadhkii ayuu jiifay, oo wuxuu kacay habeenbadhkii, oo gacanta ku qabsaday albaabbadii magaalada iriddeeda iyo labadii tiir, markaasuu fujiyey dhammaantood iyo qataarkiiba, oo garbahuu saaray, oo wuxuu la tegey buurta Xebroon ku hor taal dusheeda. 4 Dabadeedna wuxuu jeclaaday naag joogta dooxadii Soreq, oo magaceedana la odhan jiray Deliilaah. 5 Oo amiirradii reer Falastiin ayaa u yimid iyadii, oo waxay ku yidhaahdeen, Bal sasab isaga oo soo ogow meesha xooggiisa weynu kaga jiro, iyo sida aannu kaga adkaan karno, oo aannu intaannu xidhno u saxariirin karno; oo midkayo kastaaba wuxuu ku siin doonaa kun iyo boqol xabbadood oo lacag ah. 6 Markaasay Deliilaah Samsoon ku tidhi, Waan ku baryayaaye ii sheeg meesha xooggaaga weynu kaaga jiro, oo maxaa lagugu xidhi karaa si laguu saxariiriyo. 7 Oo Samsoonna wuxuu iyadii ku yidhi, Haddii laygu xidho toddoba xadhig oo qoyan oo aan weligood engegin, markaasaan taag yaraanayaa, oo waxaan noqonayaa sida dadka kale. 8 Markaasay amiirradii reer Falastiin iyadii u keeneen toddoba xadhig oo qoyan oo aan engegin, oo iyana isagii bay ku xidhay xadhkihii. 9 Haddaba waxay haysatay niman gaadmo ah oo joogay qolka hoose. Oo waxay isagii ku tidhi, Samsoonow, reer Falastiin way ku hayaan. Oo xadhkihiina wuxuu u jaray sidii shootali dab la saaray u go'o oo kale. Taas darteed xooggiisii meeluu ku jiro lama ogaan. 10 Markaasay Deliilaah Samsoon ku tidhi, Bal eeg, waad igu majaajilootaye. Oo been baad ii sheegtay, haddaba waan ku baryayaaye, ii sheeg waxa lagugu xidhi karo. 11 Oo isna wuxuu ku yidhi, Haddii laygu xidho xadhko cuscusub oo aan lagu shaqayn, markaas waan taag yaraanayaa, oo waxaan noqonayaa sida dadka kale. 12 Markaasay Deliilaah qaadday xadhko cuscusub oo ku xidhay isagii, oo waxay ku tidhi, Samsoonow, reer Falastiin way ku hayaan. Nimankii gaadmadii ahaana waxay ku jireen qolka hoose. Markaasuu xadhkihii gacmihiisa uga jaray sida dunta oo kale. 13 Markaasay Deliilaah Samsoon ku tidhi, Haddaba tan iyo markii hore waad igu majaajilootay, oo been baad ii sheegtay. Ii sheeg waxa lagugu xidhi karo. Kolkaasuu ku yidhi, Toddobada raamood ee madaxayga haddaad dharsameeye duntiis kula tidicdid waan taag yaraanayaa. 14 Markaasay qodob ku qodobtay oo ku tidhi, Samsoonow, reer Falastiin waa ku hayaan. Oo intuu hurdadii ka soo toosay ayuu rujiyey qodobkii iyo looxii dunta, iyo duntii dharsameeyaha. 15 Markaasay isagii ku tidhi, Sidee baad u odhan kartaa, Waan ku jeclahay, adigoo aanu qalbigaagu ila jirin? Bal eeg, saddex jeer baad igu majaajilootay oo iimana aad sheegin meesha xooggaaga weynu ku jiro. 16 Oo markay maalin walba hadalkeedii ku sii cadaadisay, oo ay ku adkaysay, ayaa naftiisii cidhiidhi gashay ilaa dhimasho. 17 Oo markaasuu u sheegay wixii qalbigiisa ku jiray oo dhan oo ku yidhi, Madaxayga mandiil lama marin, waayo, tan iyo markaan dhashay waxaan ahaa Nadiir Ilaah loo soocay. Haddii la ii xiiro, xooggaygu waa iga tegayaa, oo waan taag yaraanayaa, oo waxaan noqonayaa sida dadka kale. 18 Deliilaahna markay ogaatay inuu u wada sheegay wixii qalbigiisa ku jiray oo dhan ayay u cid dirtay oo u yeedhay amiirradii reer Falastiin, oo waxay ku tidhi, Bal markan ii kaalaya, waayo, wixii qalbigiisa ku jiray oo dhan wuu ii sheegay. Markaasay amiirradii reer Falastiin iyadii u yimaadeen oo lacagtiina gacantooday ugu soo qaadeen. 19 Markaasay intay isagii ku seexisay jilbaheedii, ayay nin u yeedhatay, oo waxay ka xiirtay toddobadii raamood ee madaxiisa, dabadeedna waxay bilowday inay saxariiriso, oo xooggiisiina waa ka tegey. 20 Markaasay ku tidhi, Samsoonow, reer Falastiin waa ku hayaan. Kolkaasuu hurdadiisii ka soo toosay, oo wuxuu yidhi, Sidii mararkii kale ayaan bixi doonaa oo isgilgili doonaa. Laakiinse isma uu ogayn in Rabbigu ka tegey isaga. 21 Markaasay reer Falastiin isagii qabteen, indhihiisiina way ka rideen, kolkaasay isagii keeneen Gaasa, oo waxay ku xidheen silsilado naxaas ah; oo isna wax buu ku ridqi jiray xabsiga. 22 Habase yeeshee timihii madaxiisu waxay bilaabeen inay soo baxaan kolkii la xiiray dabadeed. 23 Markaasay amiirradii reer Falastiin isu soo urursadeen inay allabari weyn u bixiyaan

ilaahood oo ahaa Daagoon, iyo inay reyreeyaan; waayo,
waxay isku yidhaahdeen, Cadowgeennii Samsoon ahaa
waxaa gacanteenna soo geliyey ilaaheen. 24 Oo dadkiina
markay isagii arkeen ayay ilaahood ammaaneen; waayo,
waxay yidhaahdeen, Ilaaheen wuxuu gacanteenna soo
geliyey kii ahaa cadowgeennii iyo kii dalkeenna baabbi'in
jiray oo layn jiray kuwo badan oo inaga mid ah. 25 Oo
markii qalbigoodii farxay ayay yidhaahdeen, Samsoon u
yeedha ha noo cayaaree. Markaasay Samsoon xabsigii uga
yeedheen, oo hortooduu ku cayaaray. Kolkaasay waxay
isagii taageen tiirarkii dhexdooda. 26 Markaasuu Samsoon
ku yidhi yarkii hagayay, Bal i daa aan taabtee tiirarka gurigu
ku taagan yahaye, oo aan ku tiirsadee. 27 Oo gurigana
waxaa ka buuxay rag iyo dumarba, oo amiirradii reer
Falastiin oo dhammuna halkaasay wada joogeen; saqafkana
waxaa dul joogay dad ku dhow saddex kun oo rag iyo
dumarba leh, oo daawanayay intuu Samsoon cayaarayay.
28 Markaasuu Samsoon Rabbiga baryay, oo yidhi, Sayidow,
Rabbiyow, waan ku baryayaaye, i xusuuso, oo waan ku
tuugayaaye, markan keliya xoog ii yeel, Ilaahow, si aan
reer Falastiin haddiiba uga magdhowdo labadaydii indhood.
29 Markaasuu Samsoon qabsaday labadii tiirdhexaad oo
gurigu ku taagnaa, wuuna ku tiirsaday, oo mid wuxuu ku
qabsaday gacantiisii midig, kii kalena wuxuu ku qabsaday
bidixdiisii. 30 Markaasuu Samsoon yidhi, Aan reer Falastiin la
dhinto. Oo wuxuu la foororsaday itaalkiisii oo dhan, gurigiina
wuxuu ku dhacay amiirradii iyo dadkii ku jiray oo dhan.
Sidaasay kuwuu markuu dhintay laayay uga sii badnaayeen
kuwuu laayay markuu noolaa. 31 Markaasay walaalihiis
iyo reer aabbihiis oo dhammu soo dhaadhaceen, oo intay
qaadeen isagii ayay keeneen oo ku aaseen meel u dhexaysa
Sorcaah iyo Eshtaa'ool, taasoo ahayd xabaashii aabbihiis
Maanoo'ax. Oo isna wuxuu reer binu Israa'iil xukumayay
labaatan sannadood.

**17** Oo waxaa jiray nin degganaa dalka buuraha leh
oo reer Efrayim; magiciisana waxaa la odhan jiray
Miikaah. 2 Oo isna wuxuu hooyadiis ku yidhi, Kun iyo
boqolkii xabbadood oo lacagta ahaa ee lagaa qaaday, ee
aad ku habaartamaysay ee aad igu dhego hadlaysay, lacagtii
anigaa haya; oo anaa qaaday. Markaasay hooyadiis tidhi,
Wiilkaygiiyow, Rabbigu ha ku barakeeyo. 3 Oo kun iyo
boqolkii xabbadood oo lacagta ahaa ayuu u soo celiyey
hooyadiis, markaasay hooyadiis tidhi, Sida runta ah waxaan
lacagta u soocay Rabbiga, oo gacantaydaan ka bixiyey
wiilkayga aawadiis in laga sameeyo sanam xardhan iyo
sanam la shubay; taas aawadeed adigaan kuu soo celin
doonaa. 4 Oo markuu lacagtii hooyadiis u soo celiyey ayay
hooyadiis qaadatay laba boqol oo xabbadood oo lacag ah,
oo waxay u dhiibtay lacagtume, oo isna wuxuu ka sameeyey
sanam xardhan iyo sanam la shubay; waxayna yaalleen
gurigii Miikaah. 5 Oo ninkii Miikaah ahaana wuxuu lahaa
guri ilaahyood, oo wuxuu sameeyey eefod iyo teraafiim,
oo wuxuuna quduus ka dhigay wiilashiisii midkood, oo
isna wuxuu u noqday wadaadkiisii. 6 Waagaasna reer
binu Israa'iil boqor ma ay lahayn; oo nin walubana wuxuu
samayn jiray wixii isaga la qumman. 7 Oo waxaa jiray nin
dhallinyaro ahaa oo ka soo baxay Beytlaxam Yahuudah oo
reer Yahuudah ahaa, ee qoladiisu ahayd reer Laawi, oo
halkaasuu degganaan jiray. 8 Markaasuu ninkii ka baxay
magaaladii ahayd Beytlaxam Yahuudah, inuu dego meel uu
heli karo; oo intuu socday ayuu yimid gurigii Miikaah oo ku yiil
dalkii buuraha lahaa oo reer Efrayim. 9 Markaasuu Miikaah
ku yidhi isagii, Xaggee baad ka timid? Isna wuxuu yidhi,
Anigu waxaan ahay reer Laawi, oo Beytlaxam Yahuudah
ayaan ka imid, oo waxaan u socdaa inaan dego meel
aan heli karo. 10 Markaasuu Miikaah ku yidhi isagii, Aniga
ila joog, oo ii noqo aabbe iyo wadaad, anna sannaddiiba
waxaan ku siinayaa toban xabbadood oo lacag ah, iyo isku
joog dhar ah, iyo cuntadaada. Sidaas daraaddeed kii reer
Laawi guduhuu galay. 11 Oo kii reer Laawina raalli buu ka
ahaa inuu ninkii la joogo; oo ninkii dhallinyarada ahaana
wuxuu Miikaah u ahaa sida wiilashiisa midkood oo kale.
12 Markaasuu Miikaah quduus ka dhigay kii reer Laawi,
oo ninkii dhallinyarada ahaana wuxuu Miikaah u noqday
wadaadkiisii, oo gurigii Miikaah ayuu joogay. 13 Markaasuu
Miikaah yidhi, Haatan waan ogsoo nahay in Rabbigu wanaag
ii samaynayo, maxaa yeelay, waxaa wadaad ii noqday nin
reer Laawi ah.

**18** Waagaas reer binu Israa'iil boqor ma ay lahayn; oo
qabiilkii reer Daan waxay wakhtigaas doonayeen dal
dhaxal u ah oo ay degaan; waayo, ilaa maalintaas dhaxal
kama ay helin qabiilooyinka reer binu Israa'iil. 2 Markaasay
reer Daan qabiilkoodii oo dhan ka direen shan nin oo
xoog leh, oo waxay ka direen Sorcaah iyo Eshtaa'ool,
inay dalka soo basaasaan oo ay soo baadhaan; oo waxay
ku yidhaahdeen, Taga oo dalka soo baadha. Markaasay
yimaadeen gurigii Miikaah oo ku yiil dalkii buuraha lahaa oo
reer Efrayim, oo meeshaasay u hoydeen. 3 Oo markay gurigii
Miikaah ag joogeen ayay garteen codkii ninkii dhallinyarada
ahaa oo reer Laawi. Markaasay halkaas ku leexdeen, oo
waxay ku yidhaahdeen, War yaa halkan ku keenay? Oo
maxaad ka samaysaa meeshan? Maxaadse ku haysataa

halkan? 4 Oo isna wuxuu ku yidhi iyagii, Sidan iyo sidaas
ayaa Miikaah ii sameeyey, wuuna i kiraystay, oo anna waxaan
noqday wadaadkiisii. 5 Oo iyana waxay ku yidhaahdeen,
Waannu ku baryaynaaye, bal Ilaah talo noo weyddii, inaannu
ogaanno bal inaannu jidkayaga aan ku soconno ku soo
liibaanayno iyo in kale. 6 Markaasuu wadaadkii ku yidhi,
Nabad ku taga; waayo, jidka aad ku socotaan wuxuu
hor yaallaa Rabbiga. 7 Markaasay shantii nin tageen, oo
yimaadeen Layish oo waxay arkeen dadkii halkaa joogay oo
ammaan ku deggan siday reer Siidoon u xasilloonaayeen oo
ammaan u ahaayeen oo kale; waayo, dalka laguma arag
wax amar haysta, oo ka xishoodsiinaya, oo reer Siidoonna
way ka fogaayeen, oo ninnaba lama ay macaamiloon
jirin. 8 Markaasay nimankii walaalahood ugu yimaadeen
Sorcaah iyo Eshtaa'ool. Kolkaasaa walaalahood waxay
ku yidhaahdeen, War bal warrama. 9 Oo iyana waxay ku
yidhaahdeen, War kaca oo ina keena aynu ku duullee,
waayo, waannu soo aragnay dalkii, oo aad buu u wanaagsan
yahay. Miyaad iska aamusnaanaysaan? War ha ka caajisina
inaad tagtaan oo aad dalka gashaan oo dhaxashaan. 10
Markaad tagtaan waxaad u tegi doontaan dad ammaan ah,
oo dalkuna waa ballaadhan yahay; waayo, Ilaah gacantuu
idiin geliyey, oo waa meel aan waxba looga baahnayn waxa
dhulka laga helo oo dhan. 11 Markaas reer Daan waxaa
halkaas kaga bixitimay oo Sorcaah iyo Eshtaa'ool ka tegey
lix boqol oo nin oo hubkii dagaalka xidhan. 12 Markaasay
baxeen oo degeen Qiryad Yecaariim oo ku taal Yahuudah;
sidaas daraaddeed meeshaas waxay u bixiyeen Maxaneh
Daan, oo ilaa maanta waa la yidhaahdaa; oo waxay ka
dambaysaa Qiryad Yecaariim. 13 Oo halkaasna way ka
tageen oo waxay u kaceen dalkii buuraha lahaa oo reer
Efrayim, markaasay yimaadeen gurigii Miikaah. 14 Kolkaasaa
shantii nin oo waddanka Layish soo basaastay waxay ku
jawaabeen oo walaalahood ku yidhaahdeen, War ma og
tihiin inay guryahan ku jiraan eefod iyo teraafiim, iyo sanam
xardhan iyo sanam la shubay? Haddaba sidaas daraaddeed
ka fiirsada waxaad samayn lahaydeen. 15 Oo intay halkaas
ku soo leexdeen ayay yimaadeen gurigii ninkii dhallinyarada
ahaa oo reer Laawi, kaasoo ahaa gurigii Miikaah, wayna
nabdaadiyeen. 16 Markaasay lixdii boqol oo nin ee hubka
dagaalka xidhnayd ee ahaa reer Daan ag istaageen iridda
laga soo galo. 17 Markaasay shantii nin oo dalka soo
basaastay yimaadeen oo gudaha galeen, oo waxay soo
qaateen sanamkii xardhanaa, iyo eefodkii, iyo teraafiimkii,
iyo sanamkii la shubay; oo wadaadkiina wuxuu iridda laga
soo galo isla taagay lixdii boqol oo nin ee xidhnayd hubka
dagaalka. 18 Oo kuwaasu markay galeen gurigii Miikaah,
oo ay soo qaateen sanamkii xardhanaa, iyo eefodkii, iyo
teraafiimkii, iyo sanamkii la shubay, ayuu wadaadkii ku yidhi,
War maxaad samaynaysaan? 19 Oo iyana waxay isagii ku
yidhaahdeen, Iska aamus, oo gacanta afka saar, ee haddaba
na soo raac, oo noo noqo aabbe iyo wadaad; bal kee baa
kuu roon, inaad nin keliya reerkiis wadaad u ahaatid, iyo
inaad wadaad u ahaatid qabiil iyo jilib reer binu Israa'iil ka
mid ah? 20 Markaasuu wadaadkii qalbiga ka farxay, oo
qaaday eefodkii iyo teraafiimkii, iyo sanamkii xardhanaa,
oo wuxuu dhex galay dadka. 21 Markaasay noqdeen oo
tageen, oo waxay iska horraysiiyeen dhallaankii, iyo xoolihii
iyo alaabtii. 22 Oo markay ka fogaadeen gurigii Miikaah
ayaa raggii joogay guryihii u dhowaa gurigii Miikaah soo
wada ururay, oo waxay gaadheen reer Daan. 23 Oo waxay u
dhawaaqeen reer Daan. Iyana intay ku soo jeesteen ayay
Miikaah ku yidhaahdeen, War maxaa kaa qaylisiinaya oo
aad guutada caynkan ah u soo kaxaysatay? 24 Isna wuxuu
yidhi, Waxaad iga qaadateen ilaahyadaydii aan sameeyey,
iyo wadaadkaygii, oo waad tagteen, haddaba maxaan kaloo
haystaa? Haddaba sidee baad ii leedihiin, War maxaa kaa
qaylisiinaya? 25 Markaasay reer Daan ku yidhaahdeen,
War hoy, codkaaga yaan dhexdayada laga maqlin, waaba
intaasoo ay ragga cadhaysanu ku dilaan, oo aad weydaa
naftaada iyo nafta reerkaagaba. 26 Markaasay reer Daan
iska tageen. Oo Miikaahna markuu arkay inay aad uga xoog
badan yihiin ayuu iska noqday oo gurigiisii tegey. 27 Oo iyana
waxay la tageen wixii Miikaah sameeyey, iyo wadaadkiisii,
markaasay yimaadeen Layish, iyo dad xasilloon oo ammaan
u fadhiya, oo waxay ku laayeen seef; oo magaaladiina
dab bay ku gubeen. 28 Oo badbaadiyena ma ay lahayn,
maxaa yeelay, Siidoon way ka fogayd, oo ninnaba lama
ay macaamiloon jirin; oo waxay ku tiil dooxada u dhow
Beytrexob. Oo iyana intay magaaladii dhiseen ayay degeen.
29 Oo magaaladii magaceediina waxay u bixiyeen Daan,
oo waxay ku sammiyeen magicii awowgood Daan, kii u
dhashay Israa'iil; habase yeeshee magaalada magaceedu
wuxuu markii hore ahaa Layish. 30 Markaasay reer Daan
qotonsadeen sanamkii xardhanaa; oo Yoonaataan oo ahaa
ina Gershoom oo ina Muuse ahaa iyo wiilashiisiiba waxay
wadaaddo u ahaayeen qabiilkii reer Daan ilaa wakhtigii dalka
la qabsaday. 31 Oo waxay qotonsadeen sanamkii xardhanaa
oo Miikaah sameeyey, oo intii guriga Ilaah Shiiloh ku yiil oo
dhan ayuu oolli jiray.

**19** Oo waagaas markii aanay reer binu Israa'iil boqor
lahayn, waxaa jiray nin reer Laawi ah oo degganaa
dhanka shishe oo dalka buuraha leh oo reer Efrayim, oo

kaasuna addoon buu ka guursaday Beytlaxam Yahuudah.
2 Markaasay naagtiisii addoonta ahayd ka dhillowday, oo
intay isagii ka tagtay ayay aadday gurigii aabbeheed oo ku
yiil Beytlaxam Yahuudah, oo halkaasay joogtay intii afar
bilood ah. 3 Markaasuu ninkeedii kacay oo iyadii doonay,
inuu si raxmad leh ula hadlo oo soo celiyo; oo wuxuu u
tegey iyadii, isagoo wata midiidinkiisii iyo laba dameer.
Markaasay isagii soo gelisay gurigii aabbeheed; oo gabadha
aabbeheedna markuu isagii arkay ayuu ku farxay inuu la
kulmo. 4 Markaasaa soddoggiis oo gabadha aabbeheed
ahaa ayaa raajiyey isagii, oo saddex maalmood ayuu la
joogay; markaasay wax cuneen oo cabbeen oo halkaasay ku
hoydeen. 5 Oo maalintii afraad aroor hore ayay tooseen, oo
wuxuuna u kacay inuu tago. Markaasaa gabadha aabbeheed
wuxuu ku yidhi wiilkii uu soddogga u ahaa, Bal nafta ugu
raaxee wuxoogaa cunto ah, dabadeedna waad tegaysaaye.
6 Sidaas daraaddeed way fadhiisteen, oo labadoodiiba
wax bay wada cuneen oo cabbeen, markaasaa gabadha
aabbeheed wuxuu ninkii ku yidhi, Waan ku baryayaaye,
raalli ahow, caawa oo dhanna iska joog, oo qalbigaaguna
ha faraxsanaado. 7 Markaasuu ninkii u kacay inuu tago;
laakiinse soddoggiis baa ku sii adkeeyey, oo halkaasuu ku
hoyday haddana. 8 Oo haddana maalintii shanaad ayuu aroor
hore u kacay inuu tago; markaasaa gabadha aabbeheed
ku yidhi, Waan ku baryayaaye iska raaxayso, oo iska joog
ilaa gelinka dambe, oo labadoodiiba wax bay wada cuneen.
9 Oo markii ninkii u kacay inuu tago, isagii iyo naagtiisii
addoonta ahayd, iyo midiidinkiisiiba, ayaa soddoggiis oo
ahaa gabadha aabbeheed ku yidhi, Bal eeg haatan qorraxdu
waa sii dhacaysaaye, haddaba waan ku baryayaaye, bal
caawa oo dhanna iska joog; bal eeg haatan waa gabbaldhac,
de halkan isaga hoyo, in qalbigaagu iska faraxsanaado;
oo haddana berri aroorta hore iska tag oo gurigaagii aad.
10 Laakiinse ninkii ma doonaynin inuu habeenkaas joogo,
wuuse kacay oo tegey, oo wuxuu yimid meel ku toosan
Yebuus, (taas oo ah Yeruusaalem); oo wuxuu watay laba
dameer oo kooraysan, oo naagtiisii addoonta ahaydna way
la socotay. 11 Oo markay Yebuus ku soo dhowaadeenna
maalintii horay u badatay; markaasaa midiidinkii wuxuu
sayidkiisii ku yidhi, Waan ku baryayaaye, kaalay oo aynu ku
leexanno magaaladan reer Yebuus oo aynu u hoyanno. 12
Kolkaasaa sayidkiisii ku yidhi, Dad shisheeye ah oo aan
reer binu Israa'iil ahayn magaaladiis ku leexan mayno;
laakiinse waxaynu u gudbaynaa xagga Gibecaah. 13 Oo
wuxuu midiidinkiisii ku yidhi, Kaalay oo aynu ku dhowaanno
meelahan middood; oo waxaynu u hoyanaynaa Gibecaah,
ama Raamaah. 14 Kolkaasay iska sii socdeen oo jidkoodii
qaadeen; oo waxaa qorraxdu ugu dhacday iyagoo ag jooga
Gibecaah oo ay reer Benyaamiin lahaayeen. 15 Markaasay
halkaas ku leexdeen inay u hoydaan Gibecaah. Kolkaasuu
galay, oo wuxuu fadhiistay jidkii magaalada; waayo, ninna
gurigiisii ma gelin inay u hoydaan. 16 Oo fiidkii oday baa
shuqulkiisii beerta ka yimid. Haddaba ninku wuxuu ahaa
reer Efrayimkii dalka buuraha leh degganaa, oo Gibecaahna
qariib buu ku ahaa; laakiinse dadkii meesha degganaa
waxay ahaayeen reer Benyaamiin. 17 Markaasuu indhihiisii
kor u qaaday, oo wuxuu jidkii magaalada ku arkay ninkii
socotada ahaa. Markaasaa odaygii yidhi, Xaggee baad u
socotaa? Oo xaggee baad ka timid? 18 Oo isna wuxuu
ku yidhi, Waxaannu ka gudbaynaa Beytlaxam Yahuudah;
oo dhanka shishe oo dalka buuraha leh oo reer Efrayim
ayaannu tegaynaa. Anigu xaggaas baan ka imid, oo waxaan
tegey Beytlaxam Yahuudah; oo haatan waxaan u socdaa
guriga Rabbiga, oo nin gurigiisa i geliyeyna ma jiro. 19 Weliba
dameerahayaga waa loo hayaa caws iyo cuntoba; oo kibis
iyo khamrina waa u diyaar aniga iyo gabadhaada addoonta
ah, iyo weliba ninka dhallinyarada ah ee nala socda annagoo
addoommadaada ah, haddaba wax loo baahan yahay ma
jiraan. 20 Oo markaasaa odaygii yidhi, Nabadu ha kula
jirto; habase yeeshee waxaad u baahan tahay oo dhammu
ha i saarnaadeen; laakiin jidka ha u hoyan. 21 Markaasuu
gurigiisii geliyey, oo dameerihii cuntuu siiyey; oo iyana intay
cago maydheen ayay wax cuneen oo cabbeen. 22 Oo
intay farxayeen waxaa yimid raggii magaalada oo niman
xunxun ah, oo intay guriga hareereeyeen ayay albaabkii
garaaceen, markaasay la hadleen odaygii guriga lahaa, oo
ku yidhaahdeen, Noo soo bixi ninkii gurigaaga soo galay,
aannu u tagnee. 23 Markaasaa ninkii guriga lahaa dibadda
ugu baxay oo ku yidhi, Maya, walaalahayow, waan idin
baryayaaye, ha samaynina wax sidaas u shar ah, maxaa
yeelay, ninkanu gurigayguu galay ee ha ku samaynina
xumaantan. 24 Bal eega, waxaa jooga gabadhaydii oo bikrad
ah iyo naagtiisii addoonta ahayd; haddaba iyagaan idiin soo
bixinayaaye, iyaga kufsada oo sidaad doonaysaan ka yeela;
laakiinse ninkan ha ku samaynina xumaan caynkan ah. 25
Laakiinse raggii ma ay doonaynin inay dhegaystaan, sidaas
daraaddeed ninkii wuxuu qabtay naagtiisii addoonta ahayd,
dibadduuna ugu soo saaray; kolkaasay iyadii kufsadeen, oo
si xun bay u galeen habeenkii oo dhan ilaa subaxdii; oo
markii waagu baryayay ayay iska sii daayeen. 26 Markaasaa
naagtii timid markii waagu soo kaahay, oo waxay ku dhacday
albaabkii ninkii gurigiisa oo uu sayidkeedii joogay, ilaa ay
iftiin noqotay. 27 Markaasaa sayidkeedii kacay aroortii,
oo albaabbadii guriga furay, oo inuu tago ayuu dibadda

ugu soo baxay; oo bal eeg, naagtiisii addoonta ahayd
waxay ku dhacday guriga iriddiisa, oo gacmaheeduna waxay
saarnaayeen marinka. 28 Markaasuu iyadii ku yidhi, Naa
bal kac, oo ina keen aan tagnee; laakiinse cidna uma ay
jawaabin; markaasuu dameerkiisii saaray, oo meeshiisii u
kacay. 29 Oo markuu gurigiisii galay ayuu mindi qaaday, oo
intuu naagtiisii addoonta ahayd qabtay ayuu xubin xubin
u kala gooyay, oo wuxuu ka dhigay laba iyo toban cad,
oo wuxuu u diray xuduudka reer binu Israa'iil oo dhan
inta ka dhex leh. 30 Oo kulli wax alla wixii arkayba waxay
yidhaahdeen, Maalintii ay dalka Masar ka soo baxeen ilaa
maantadan la joogo reer binu Israa'iil laguma samayn,
lagumana arag, shuqul caynkan ah; haddaba bal ka fiirsada,
oo ka tashada, oo ka hadla.

**20** Markaasay reer binu Israa'iil oo dhammu soo wada
baxeen, oo shirkiina wuxuu u soo ururay sidii nin
qudha, oo waxay ka soo shireen tan iyo Daan iyo xataa
Bi'ir Shebac, iyo weliba dalka reer Gilecaad, oo waxay
Rabbiga ugu soo shireen Misfaah. 2 Markaasaa dadka
madaxdiisii oo dhan ee ka socda qabiilooyinka reer binu
Israa'iil oo dhan ayaa isa soo dhex taagay dadka Ilaah
shirkiisii, kuwaasoo ahaa afar boqol oo kun oo nin oo lug
ah oo wada seefqaad ah. 3 (Markaasaa reer Benyaamiin
waxay maqleen in reer binu Israa'iil Misfaah tageen.) Oo
reer binu Israa'iilna waxay yidhaahdeen, War bal noo sheeg
siday xumaantanu u dhacday. 4 Markaasuu kii reer Laawi
oo ahaa ninkii qabay naagtii la dilay jawaabay oo yidhi,
Waxaan imid magaalada Gibecaah oo reer Benyaamiin ay
leeyihiin, oo waxaannu doonaynay inaannu ku hoyanno
aniga iyo naagtaydii addoonta ahayd. 5 Markaasay raggii
reer Gibecaah igu kaceen, oo habeennimo ayay gurigii igu
hareereeyeen, oo waxay damceen inay i dilaan, naagtaydii
addoonta ahaydna way kufsadeen, wayna dhimatay. 6
Oo anna intaan naagtaydii addoonta ahayd qaaday ayaan
cadcad u kala googooyay, oo waxaan u diray dalkii ay reer
binu Israa'iil dhaxalka u heleen oo dhan; waayo, waxay reer
binu Israa'iil ku dhex sameeyeen wasakhnimo iyo xumaan.
7 Hadda kulligiin reer binu Israa'iilow, bal ka tashada oo
ka arrinsada. 8 Markaasaa dadkii oo dhammu isku mar
isla kacay sidii nin qudha, oo waxay yidhaahdeen, Annaga
midkayana tegi maayo teendhadiisii, oo midkayana ku leexan
maayo gurigiisii. 9 Laakiinse waxa aannu Gibecaah ku
samaynaynaa waa kan; saami baannu ku weeraraynaa. 10
Qabiilooyinka reer binu Israa'iil oo dhan boqolkiiba toban nin
baannu kala baxaynaa, kunkiina waxaannu kala baxaynaa
boqol nin, tobankii kunna waxaannu kala baxaynaa kun nin,
inay dadka sahay u keenaan si markii ay tagaan Gibecaahda
reer Benyaamiin ay wax ugu sameeyaan xumaantii ay
ku dhex sameeyeen reer binu Israa'iil aawadeed. 11 Oo
sidaasay raggii reer binu Israa'iil oo dhammu isugu soo
urursadeen magaaladii, iyagoo u midoobay sidii nin qudha.
12 Markaasay qabiilooyinkii reer binu Israa'iil rag u direen
qabiilkii reer Benyaamiin oo dhan, oo waxay ku yidhaahdeen,
War xumaantan dhexdiinna ka dhacday waa maxay? 13
Haddaba sidaas daraaddeed nimanka xunxun ee Gibecaah
jooga noo soo bixiya, aannu dilnee, oo aannu reer binu
Israa'iil sharka ka dhex fogaynee. Laakiinse reer Benyaamiin
ma ay doonaynin inay dhegaystaan codkii reer binu Israa'iil
oo walaalahood ahaa. 14 Oo reer Benyaamiinna waxay
iska soo urursadeen magaalooyinkii, oo waxay ku soo
shireen Gibecaah, inay ku duulaan reer binu Israa'iil. 15 Oo
maalintaas waa la tiriyey reer Benyaamiinkii magaalooyinka
ka baxay, oo waxay noqdeen lix iyo labaatan kun oo seefqaad
ah, iyo weliba kuwii Gibecaah degganaa oo tiradoodii ahayd
toddoba boqol oo nin oo la soo xulay. 16 Oo dadkaas oo
dhanna waxaa ka mid ahaa toddoba boqol oo nin oo la
soo xulay oo wada gurran, oo mid waluba ka dhaadhacay
wadhafka tuuristiisa oo xataa uusan la waayayn tin. 17
Oo raggii reer binu Israa'iil oo reer Benyaamiin aanay ku
jirinna tiradoodii waxay ahayd afar boqol oo kun oo nin
oo wada seefqaad ah; oo kulligoodna waxay ahaayeen
rag dagaalgal ah. 18 Markaasay reer binu Israa'iil kaceen,
oo waxay tageen Beytel, oo Ilaah bay talo weyddiisteen.
Oo waxay yidhaahdeen, Yaa reer Benyaamiin marka hore
noogu duulaya? Markaasaa Rabbigu wuxuu ku yidhi, Reer
Yahuudah ha u horreeyeen. 19 Subaxdii dambe ayay reer
binu Israa'iil kaceen, oo ag degeen Gibecaah. 20 Oo raggii
reer binu Israa'iil waxay u soo baxeen inay reer Benyaamiin
ku duulaan; oo reer binu Israa'iilna Gibecaah bay isugu
diyaariyeen inay reer Benyaamiin la dagaallamaan. 21
Markaasay reer Benyaamiin ka soo baxeen Gibecaah, oo
baabbi'iyeen reer binu Israa'iil, oo maalintaas waxay ka
laayeen laba iyo labaatan kun oo nin. 22 Markaasay raggii
reer binu Israa'iil isdhiirrigeliyeen, oo mar kalay dagaal
isugu soo diyaariyeen meeshii ay maalintii hore isku soo
diyaariyeen. 23 (Markaasay reer binu Israa'iil tageen oo ilaa
fiidkii ku hor ooyeen Rabbiga, oo Rabbigay weyddiisteen
iyagoo leh, Miyaannu haddana u dhowaannaa inaannu
walaalahayo reer Benyaamiin la dirirno? Markaasuu Rabbigu
ku yidhi, Taga oo la dirira.) 24 Oo haddana maalintii labaad
ayaa reer binu Israa'iil u soo dhowaadeen reer Benyaamiin.
25 Kolkaasay reer Benyaamiin maalintii labaad kaga soo
baxeen Gibecaah, oo haddana waxay baabbi'iyeen reer binu
Israa'iil, oo waxay ka laayeen siddeed iyo toban kun oo

nin oo wada seefqaad ah. **26** Markaasay reer binu Israa'iil
oo dhan iyo dadkii oo dhammu wada tageen oo waxay
yimaadeen Beytel, oo intay Rabbiga hor fadhiisteen ayay
ooyeen, oo maalintaasna ilaa fiidkii way soomanaayeen;
oo waxay Rabbiga hortiisa ku bixiyeen qurbaanno la gubo
iyo qurbaanno nabaadiino. **27** Markaasay reer binu Israa'iil
haddana Rabbiga wax weyddiisteen, (waayo, wakhtigaas
waxaa halkaas oolli jiray sanduuqii axdiga Ilaah, **28** oo
wakhtigaas waxaa is-hor taagi jiray Fiinexaas ina Elecaasaar
oo ina Haaruun ahaa), oo waxay yidhaahdeen, Miyaannu
mar kale haddana ku duulnaa walaalahayo reer Benyaamiin,
mise waannu ka joogsannaa? Markaasuu Rabbigu ku yidhi,
Taga, waayo, berri baan gacanta idiin soo gelin doonaa.
**29** Markaasay reer binu Israa'iil Gibecaah hareeraheeda
dhigeen rag gaadmo ah. **30** Oo haddana maalintii saddexaad
reer binu Israa'iil waxay ku soo kaceen reer Benyaamiin,
oo waxay dagaal isugu diyaariyeen Gibecaah sidii mararkii
hore. **31** Oo reer Benyaamiinna waxay ku soo baxeen
dadkii, oo magaaladiina waa laga fogeeyey, oo waxay
bilaabeen inay dadkii laayaan oo dilaan sidii mararkii hore,
oo waxay ku laayeen waddooyinkii waaweynaa kuwaasoo
middood Beytel loo maro, tan kalena Gibecaah loo maro,
iyo duurka, oo waxay dileen in ku dhow soddon nin oo
reer binu Israa'iil ah. **32** Markaasay reer Benyaamiin isku
yidhaahdeen, Sidii mararkii hore ayay hortayada ugu le'deen.
Laakiinse reer binu Israa'iil waxay yidhaahdeen, War aynu
cararno, oo iyaga magaalada ka fogayno oo geeyno xagga
waddooyinka waaweyn. **33** Markaasay raggii reer binu
Israa'iil oo dhammu ka kaceen meeshoodii, oo waxay dagaal
isugu diyaariyeen Bacal Taamaar; oo raggii gaadmada ahaa
oo reer binu Israa'iilna waxay ka soo yaaceen meeshoodii,
taasoo ahayd duurka Gibecaah. **34** Oo waxaa Gibecaah hor
yimid toban kun oo nin oo laga soo doortay reer binu Israa'iil
oo dhan, oo dagaalkiina aad iyo aad buu u sii kululaaday;
laakiinse ma ay ogayn in belaayo ku soo dhow dahay. **35**
Markaasuu Rabbigu reer Benyaamiin ku laayay reer binu
Israa'iil hortooda; oo maalintaas reer binu Israa'iil waxay
reer Benyaamiin ka baabbi'iyeen shan iyo labaatan kun iyo
boqol nin oo wada seefqaad ah. **36** Sidaas daraaddeed
reer Benyaamiin waxay arkeen in la jebiyey, waayo, reer
binu Israa'iil waxay meel u banneeyeen reer Benyaamiin,
maxaa yeelay, waxay isku halleeyeen raggii qarsoonaa
ee ay Gibecaah gaadmada u geliyeen. **37** Markaasay
raggii gaadmada ahaa soo dhaqsadeen oo haddiiba ku
soo yaaceen Gibecaah, oo kuwii gaadmada ahaana intay
soo baxeen ayay magaaladii oo dhan ku laayeen seef. **38**
Haddaba reer binu Israa'iil iyo raggii gaadmada ahaa waxaa
calaamad u ahaa inay qiiq weyn ka kiciyaan magaalada. **39**
Markaasay raggii reer binu Israa'iil dagaalkii ka jeesteen,
oo reer Benyaamiinna waxay bilaabeen inay laayaan oo
dilaan, oo waxay raggii reer binu Israa'iil ka dileen in ku
dhow soddon qof; waayo, waxay isyidhaahdeen, Hubaal sidii
dagaalkii horay ku le'deen hortayada. **40** Laakiinse markii
daruurtii ka kacday magaaladii iyadoo tiir qiiq ah ayaa reer
Benyaamiin dib u fiiriyeen, oo waxay arkeen magaaladii oo
dhammaanteed qiiq samada uga baxay. **41** Markaasay raggii
reer binu Israa'iil soo jeesteen, oo raggii reer Benyaamiinna
way yaabeen; waayo, waxay arkeen in belaayo ku dhacday
iyaga. **42** Sidaas daraaddeed waxay dhabarka u jeediyeen
raggii reer binu Israa'iil, oo waxay u carareen xagga cidlada;
laakiinse dagaalkii si adag baa loola sii raacay, oo kuwii
magaalooyinka ka soo baxay ayaa labadhexaadkii ku laayay.
**43** Oo intay hareereeyeen ayay reer Benyaamiin sii eryadeen,
oo waxay ku gaadheen meeshii ay ku nasteen taasoo ka
horraysa oo xagga qorrax ka soo baxa ka xigta Gibecaah.
**44** Oo waxaa reer Benyaamiin haddana ka le'day siddeed iyo
toban kun oo nin, oo kulligoodna waxay wada ahaayeen
rag xoog badan. **45** Oo intay jeesteen ayay u carareen
xagga cidlada iyo ilaa dhagaxii weynaa oo Rimmon; oo
waxaa jidadka waaweyn lagu sii laayay shan kun oo nin; oo
waxaa loo sii raacdaystay xagga Gidcom, oo laga laayay
laba kun oo nin. **46** Sidaas daraaddeed maalintaas wixii reer
Benyaamiin ka le'day kulligood waxay ahaayeen shan iyo
labaatan kun oo nin oo seefqaad ah, oo kulligoodna waxay
wada ahaayeen rag xoog badan. **47** Laakiinse lix boqol
oo nin ayaa jeesatay oo waxay u carareen xagga cidlada
iyo ilaa dhagaxii weynaa oo Rimmon oo waxay dhagaxii
weynaa oo Rimmon joogeen afar bilood. **48** Oo raggii reer
binu Israa'iil haddana way ku soo noqdeen reer Benyaamiin,
oo waxay ku laayeen seef magaaladii oo dhan, iyo xoolihii,
iyo wixii ay heleen oo dhanba; oo weliba magaalooyinkii ay
heleen oo dhanna dab bay qabadsiiyeen.

**21** Haddaba raggii reer binu Israa'iil waxay ku dhaarteen,
iyagoo Misfaah jooga, oo waxay isku yidhaahdeen,
Midkeenna waa inaanu gabadhiisa u guurin reer Benyaamiin.
**2** Markaasaa dadkii waxay yimaadeen Beytel, oo halkaasay
Ilaah hor fadhiyeen ilaa fiidkii, oo intay codkoodii kor u
qaadeen ayay aad u ooyeen. **3** Oo waxay yidhaahdeen,
Rabbiyow, Ilaaha reer binu Israa'iilow, maxaa waxanu
uga dhex dhaceen reer binu Israa'iil in maanta qabiil ka
dhimanaado reer binu Israa'iil? **4** Oo waxay noqotay maalintii
dambe inay dadkii aroor hore kaceen oo ay halkaas ka
dhiseen meel allabari, oo waxay bixiyeen qurbaanno la

gubo iyo qurbaanno nabaadiino. 5 Oo reer binu Israa'iilna
waxay yidhaahdeen, Qabiilooyinkii reer binu Israa'iil oo
dhan yaa ka maqan oo aan iman shirka Ilaah? Waayo,
waxay ku dhaarteen dhaar weyn oo ku saabsan kii aan
Misfaah Rabbiga ugu soo shirin, oo waxay yidhaahdeen,
Hubaal kaas waa in la dilaa. 6 Oo reer binu Israa'iilna
waxay u qoomamoodeen walaalahood reer Benyaamiin,
oo waxay yidhaahdeen, Maanta waxaa jira qabiil ka go'ay
reer binu Israa'iil. 7 Sidee baynu inta ka hadhay naago ugu
yeelnaa, maxaa yeelay, waxaynu ku dhaarannay Rabbiga
inaynaan gabdhaheenna u guurin iyaga? 8 Oo waxay isku
yidhaahdeen, Qabiilooyinka reer binu Israa'iil qabiilkee baan
Rabbiga Misfaah ugu iman? Oo bal eeg, midnaba xeradii
shirka ugama iman reer Yaabeesh Gilecaad oo dhan. 9
Waayo, markii dadka la tiriyey bal eeg, halkaas ma joogin ka
mid ah dadkii Yaabeesh Gilecaad degganaa. 10 Markaasaa
shirkii wuxuu halkaas u diray laba iyo toban kun oo nin
oo xoog leh, oo waxayna ku amreen oo ku yidhaahdeen,
Taga oo seef ku laaya dadka Yaabeesh Gilecaad deggan,
iyo dumarka iyo yaryarkaba. 11 Oo waa inaad sidatan
yeeshaan, oo aad inta lab oo dhan wada baabbi'isaan,
iyo naag kasta oo nin la seexdayba. 12 Markaasay dadkii
Yaabeesh Gilecaad degganaa ka soo heleen afar boqol
oo gabdhood oo dhallinyar oo wada bikrado ah, oo aan
weligood ninna la seexan; oo waxay iyagii keeneen xeradii
Shiiloh, taasoo ku tiil dalka reer Kancaan. 13 Markaasaa
shirkii oo dhammu wuxuu u cid diray oo la hadlay reer
Benyaamiinkii joogay dhagaxii weynaa oo Rimmon, oo
waxay ugu bishaareeyeen nabad. 14 Oo markaasay reer
Benyaamiin soo noqdeen, oo waxaa la siiyey naagihii iyagoo
nool Yabeesh Gilecaad laga keenay ee ka hadhay naagihii
dalkaas; oo weliba kuma ay filnaan. 15 Oo dadkii waxay u
qoomamoodeen reer Benyaamiin, maxaa yeelay, Rabbigu
dillaac buu u yeelay qabiilooyinkii reer binu Israa'iil. 16
Markaasaa odayaashii shirku waxay yidhaahdeen, Bal inta
hadhay sidee baynu naago ugu yeelnaa, maxaa yeelay,
naagihii waa laga baabbi'iyey reer Benyaamiin? 17 Oo waxay
isku yidhaahdeen, Intii reer Benyaamiin ka baxsatay waa
inay dhaxal helaan, si aan qabiil uga baabbi'in reer binu
Israa'iil. 18 Habase ahaatee waa inaynaan gabdhaheenna
iyaga u guurin; waayo, reer binu Israa'iil waxay ku dhaarteen,
oo yidhaahdeen, Inkaaru ha ku dhacdo kii gabadh u guuriya
reer Benyaamiin. 19 Oo haddana waxay yidhaahdeen, Bal
eeg, sannad ka sannad waxaa jirta iidda Rabbiga ee lagu
sameeyo Shiiloh, taasoo woqooyi ka xigta Beytel, oo ah
dhanka bari oo waddada weyn oo Shekem aadda oo Beytel
ka tagta, iyo Leboonaah xaggeeda koonfureed. 20 Markaasay
waxay reer Benyaamiin ku amreen oo ku yidhaahdeen, Taga
oo ku gaada beeraha canabka ah dhexdooda; 21 oo bal
eega, haddii ay gabdhaha reer Shiiloh u soo baxaan inay
cayaaraan, de markaas ka soo baxa beeraha canabka ah,
oo nin kastaaba naag ha ka qabsado gabdhaha reer Shiiloh,
oo markaas waxaad la tagtaan dalka reer Benyaamiin.
22 Oo markay aabbayaashood ama walaalahood noo soo
cawdaan, waxaannu iyaga ku odhan doonnaa, Warroy
raalli nooga ahaada iyaga; maxaa yeelay, annagu ninna
dagaalkii naag ugama aannan reebin. Idinna ma aydnaan
siin iyaga, haddii kalese haatan eed baad lahaan lahaydeen.
23 Oo reer Benyaamiinna sidii bay yeeleen, oo waxay intii
tiradoodu ahaydba naago ka qaateen kuwii cayaarayay, oo
way la tageen; oo waxay tageen oo ku noqdeen dalkoodii ay
dhaxalka u heleen, oo magaalooyinkiina way dhiseen oo
degeen. 24 Oo reer binu Israa'iilna markaasay halkaas ka
tageen. Oo nin waluba wuxuu tegey qabiilkiisii iyo xaaskiisii,
oo halkaas intay ka tageen ayaa nin waluba wuxuu u kacay
dalkiisii dhaxalka ahaa. 25 Waagaasna reer binu Israa'iil
boqor ma ay lahayn; oo nin walubana wuxuu samayn jiray
wixii isaga la qumman.

# Ruud

**1** Waagii xaakinnadu wax xukumi jireen abaar baa dalkii
ka dhacday. Markaasaa nin Beytlaxam Yahuudah ka
tegey, oo wuxuu qariib ahaan u degay waddankii Moo'aab,
isagii iyo naagtiisii, iyo labadiisii wiilba. **2** Oo ninkaas
magiciisu wuxuu ahaa Eliimeleg, naagtiisana waxaa la
odhan jiray Nimco, labadiisa wiil magacyadooduna waxay
ahaayeen Maxloon iyo Kilyoon, oo qoladooduna waxay
ahayd reer Efraad oo Beytlaxam Yahuudah ka yimid. Oo
waxay soo galeen waddankii Moo'aab, oo halkaasay iska
degeen. **3** Markaasaa waxaa dhintay Eliimeleg oo ahaa
Nimco ninkeedii, oo waxaa hadhay iyadii iyo labadeedii
wiil. **4** Oo iyana waxay naago ka guursadeen dumarkii reer
Moo'aab; oo naagahoodii mid magaceedii waxaa la odhan
jiray Corfah, tan kale magaceeduna wuxuu ahaa Ruud; oo
waxay halkaas degganaayeen intii toban sannadood ku
dhow. **5** Oo haddana Maxloon iyo Kilyoon labadiiba way
dhinteen; oo naagtii waxaa ka dhintay labadeedii carruur
ahayd iyo ninkeedii. **6** Markaasay kacday iyadoo wadata
labadii gabdhood ee ay soddohda u ahayd inay ka noqoto
waddankii Moo'aab; waayo, waxay waddankii Moo'aab ku
maqashay in Rabbigu dadkiisii soo booqday oo uu cunto
siiyey. **7** Oo markaasay meeshii ay joogtay ka tagtay, oo
labadii gabdhood oo ay soddohda u ahaydna way la socdeen;
oo jidkay qaadeen inay ku noqdaan dalkii reer Yahuudah. **8**
Markaasaa Nimco waxay ku tidhi labadii gabdhood ee ay
soddohda u ahayd, Taga oo middiin kastaaba ha ku noqoto
gurigii hooyadeed; oo Rabbigu si raxmad leh ha idiin yeelo
taasoo ah sidii aad ula macaamilooteen kuwii dhintay iyo
anigaba. **9** Rabbigu middiin kastaba nasasho ha ku siiyo
guriga ninkeeda. Oo markaasay iyagii dhunkatay; oo iyana
codkoodii bay kor u qaadeen oo ooyeen. **10** Oo waxay iyadii
ku yidhaahdeen, Maya, laakiinse adigaannu kula noqonaynaa
xaggii dadkaaga. **11** Markaasay Nimco waxay tidhi, Iska
noqda, gabdhahaygiiyow, bal maxaad ii raacaysaan? Ma
wiilal kalaa uurkayga ku hadhay oo niman idiin noqonaya? **12**
Iska noqda, gabdhahaygiiyow, oo iska taga, waayo, waan ka
gaboobay inaan nin guursado. Haddii aan odhan lahaa, Weli
rajaan qabaa, iyo haddii xataa aan caawa nin guursado, ee
haddana wiilal dhalo, **13** haddaba ma waxaad sugaysaan ilaa
ay ka koraan? Oo ma sidaas baad isaga daynaysaan inaad
niman guursataan? Gabdhahaygiiyow, maya, waayo, taasaan
aad uga xumaanayaa idinka aawadiin, waayo, waxaa igu
soo baxday gacanta Rabbiga. **14** Markaasay codkoodii kor u
qaadeen oo haddana way ooyeen; Corfahna soddohdeed
bay dhunkatay; Ruudse way ku soo dhegtay. **15** Oo Nimco
waxay ku tidhi, Bal eeg, dumaashidaa waxay ku noqotay
dadkeedii iyo ilaaheedii; haddaba adna dumaashidaa daba
gal. **16** Kolkaasaa Ruud waxay ku tidhi, Ha iga baryin inaan
kaa tago, oo aan kaa noqdo, oo aanan ku raacin; maxaa
yeelay, meeshii aad tagtid waan tegi doonaa; meeshaad
degtidna waan degi doonaa, dadkaaguna wuxuu noqon
doonaa dadkayga, Ilaahaaguna wuxuu noqon doonaa
Ilaahayga. **17** Meeshaad ku dhimatid ayaan ku dhiman
doonaa, oo halkaasaa laygu aasi doonaa. Rabbigu sidaas
ha igu sameeyo iyo ka sii badanba, haddii aniga iyo adiga,
dhimasho mooyaane, wax kaleto ina kala kexeeyaan. **18** Oo
Nimco, markay aragtay inay aad iyo aad ugu adkaysatay
inay raacdo ayay hadalkii ka daysay. **19** Sidaas daraaddeed
labadoodiiba way israaceen ilaa ay yimaadeen Beytlaxam.
Oo markay Beytlaxam yimaadeen, magaaladii oo dhammu
waa ku soo ururtay, oo dumarkiina waxay yidhaahdeen, Tanu
ma Nimco baa? **20** Oo iyana waxay iyagii ku tidhi, Ha iigu
yeedhina Nimco, laakiinse waxaad iigu yeedhaan Maara;
waayo, Qaadirku wuxuu iila macaamilooday si qadhaadh.
**21** Anigoo buuxaan tegey, oo Rabbigu wuxuu i soo celiyey
anigoo madhan. Haddaba maxaad iigu yeedhaysaan Nimco?
Maxaa yeelay, Rabbigu waa igu marag furay, oo Qaadirku
waa i dhibay. **22** Sidaasay Nimco iyo Ruud tii reer Moo'aab
ee ay soddohda u ahaydba u noqdeen, oo waxay ka soo
laabteen waddankii Moo'aab oo Beytlaxam yimaadeen
markay goosashada shaciirku bilaabatay.

**2** Oo Nimco waxaa ninkeedii qaraabo u ahaan jiray nin
xoog badan oo xoolo leh oo reer Eliimeleg ah, oo
magiciisana waxaa la odhan jiray Bocas. **2** Markaasaa
Ruud tii reer Moo'aab waxay Nimco ku tidhi, Bal i daa aan
beerta tagee, oo kii iga raalli noqda, intaan raaco, aan
hadhuudh ka soo xaabxaabee. Oo iyana waxay ku tidhi,
Gabadhaydiiyey, tag. **3** Markaasay tagtay, oo markay timid,
kuwii beerta gooynayay ayay dabadood beertii xaabxaabtay.
Oo nasiibkeeduna waxaa weeye inay timaado beertii uu
lahaa Bocas oo ahaa reer Eliimeleg. **4** Oo bal eeg, Bocas
baa wuxuu ka yimid Beytlaxam, oo wuxuu ku yidhi kuwii
beerta gooynayay, Rabbigu ha idinla jiro. Oo iyana waxay
ugu jawaabeen, Rabbigu ha ku barakeeyo. **5** Markaasaa
Bocas wuxuu ku yidhi midiidinkiisii madaxda u ahaa kuwii
beerta gooynayay, Gabadhanu waa ina ayo? **6** Markaasaa
midiidinkii kuwii beerta gooynayay madaxda u ahaa wuxuu
Bocas ugu jawaabay, Waa gabadhii reer Moo'aab ee Nimco
kala soo noqotay waddankii reer Moo'aab. **7** Oo waxay
igu tidhi, Waan ku baryayaaye aan beerta xaabxaabo, oo
aan kuwa beerta gooynaya dabadood xidmooyinka wax

ka dhex urursado. Taas aawadeed way timid, oo wax bay
ururisanaysay subaxdii ilaa haatan, in yar oo ay guriga ku
maqnayd mooyaane. 8 Markaasaa Bocas wuxuu Ruud ku
yidhi, Sow maqli maysid, gabadhaydiiyey? Ha tegin oo ha
xaabxaabin beer kale, oo halkanna ha sii dhaafin, laakiinse
halkan gabdhahayga u dhow iska joog. 9 Oo waxaad fiirisaa
beerta ay gooynayaan, oo iyaga iska daba gal. Miyaanan
ragga dhallinyarada ah ku amrin inaanay ku taaban? Oo
markaad oontidna xagga weelasha tag oo ka soo cab biyaha
ragga dhallinyarada ahu soo dhaamiyeen. 10 Markaasay
wejiga u dhacday, oo dhulka ugu foororsatay, oo waxay isagii
ku tidhi, Maxaad raalli iigu noqotay, oo aad ii garatay, anoo
ah mid qalaad? 11 Markaasaa Bocas u jawaabay oo wuxuu
ku yidhi, Dhammaan waa lay wada tusay, kulli wixii aad u
samaysay soddohdaa ilaa markii ninkaagii dhintay, iyo sidii
aad uga soo kacday aabbahaa iyo hooyadaa, iyo dalkii aad
ku dhalatay, oo aad u timid dad aadan hadda ka hor aqoon.
12 Haddaba Rabbigu shuqulkaaga ha kaaga abaalgudo,
oo Rabbiga ah Ilaaha reer binu Israa'iil oo aad baalashiisa
hoostooda magan gashay ha ku siiyo abaalgud dhan. 13
Kolkaasay tidhi, Sayidow, haddaba raalli iga ahow; waayo,
waad i qalbi qaboojisay, oo si raxmad leh ayaad iila hadashay
anigoo ah addoontaada, in kastoo aanan addoommahaaga
ka mid ahayn. 14 Oo wakhtigii qadada ayaa Bocas wuxuu ku
yidhi, Kaalay halkan, oo kibista wax ka cun, oo cuntadaada
ku qoyso khalka. Oo waxay dhinac fadhiisatay kuwii beerta
gooynayay, oo waxay siiyeen hadhuudh la saloolay, oo way
cuntay, wayna dheregtay, oo wax bayna hambaysay. 15
Oo markay u kacday inay beerta soo xaabxaabto ayaa
Bocas wuxuu ku amray raggiisii dhallinyarada ahaa, Xataa
xidhmooyinka ha ka dhex xaabxaabto, oo hana canaananina.
16 Oo weliba xidhmooyinkana qaar uga soo siiba oo u
daaya, ha xaabxaabtee, oo hana dagaalina. 17 Sidaas
daraaddeed waxay beertii xaabxaabaysay ilaa fiidkii, oo way
tuntay wixii ay soo xaabxaabtay, oo waxay u noqotay in
ku dhow eefaah shaciir ah. 18 Markaasay kor u qaadatay
oo magaaladii gashay; oo soddohdeedna way aragtay
wixii ay soo xaabxaabtay; oo waxay u soo bixisay oo
siisay wixii ay hambaysay markay dheregtay. 19 Markaasaa
soddohdeed waxay ku tidhi, Xaggee baad maanta wax ka
soo xaabxaabtay? Oo xaggee baad ka shaqaysay? Ha
barakaysnaado kii ku gartay. Oo iyana waxay soddohdeed u
sheegtay kii ay la shaqaysay, oo waxay ku tidhi, Ninkii aan
maanta la shaqeeyey magiciisa waxaa la yidhaahdaa Bocas.
20 Markaasaa Nimco waxay ku tidhi gabadhii ay soddohda
u ahayd, Rabbigu ha barakeeyo kan aan roonaantiisa ka
dayn kuwa nool iyo kuwa dhintayba. Oo Nimco waxay ku
tidhi iyadii, Ninku waa noo dhow yahay oo waa xigaalkayo,
oo waa qaraabadayada noo dhow midkood. 21 Markaasaa
Ruud tii reer Moo'aab waxay tidhi, Oo weliba wuxuu igu
yidhi, Waa inaad la joogtaa raggayga dhallinyarada ah ilaa
ay dhammeeyaan beertayda ay gooynayaan. 22 Markaasaa
Nimco waxay ku tidhi gabadhii Ruud oo ay soddohda
u ahayd, Gabadhaydiiyey, waa wanaagsan tahay inaad
gabdhihiisa raacdid oo aan lagugula kulmin beer kaleto. 23
Sidaas daraaddeed waxay la sii joogtay gabdhihii Bocas
inay xaabxaabto beerta ilaa gooyntii shaciirka iyo gooyntii
sarreenkuba dhammaadeen, oo waxayna la degganayd
soddohdeed.

**3** Oo markaasaa Nimco oo ahayd soddohdeed ayaa waxay
ku tidhi, Gabadhaydiiyey, miyaanan nasasho kuu doonayn
inay ku wanaagsanaato? 2 Haddaba sow Bocas oo ka
mid ah xigaalkayaga ma joogo kaasoo aad addoommihiisii
la joogtay? Bal eeg, caawa wuxuu shaciir ku haadinayaa
meesha wax lagu tumo. 3 Haddaba maydho, oo subko, oo
dharkaagana xidho, oo waxaad tagtaa meesha wax lagu
tumayo; laakiinse ninka ha istusin ilaa uu dhammaysto waxa
uu cunayo oo cabbayo. 4 Oo markuu seexdo, meeshuu
jiifsado fiirso, oo markaas u gal, oo cagihiisa bannee, oo iska
jiifso, oo isna wuxuu kuu sheegi doonaa waxaad samayn
lahayd. 5 Oo iyana waxay Nimco ku tidhi, Waxaad tidhi oo
dhan waan yeeli doonaa. 6 Markaasay tagtay meeshii wax
lagu tumi jiray, oo waxay samaysay kulli wixii soddohdeed
ku amartay. 7 Oo Bocasna markuu wax cunay oo wax
cabbay qalbigiisu waa faraxsanaa, oo wuxuu aaday inuu
jiifsado meel tuulmo hadhuudh ah ka dambaysa. Markaasay
aayar u timid oo cagihiisii bannaysay, oo way jiifsatay. 8 Oo
habeenbadhkii ayaa ninkii argaggaxay, oo wuu isrogay, oo
bal eeg, naag baa cagihiisa jiiftay. 9 Markaasuu ku yidhi,
Tumaad tahay? Oo iyana waxay ugu jawaabtay, Waxaan
ahay addoontaadii Ruud; haddaba macawistaada ku kor
kala bixi addoontaada, waayo, waxaad tahay xigaal ii dhow.
10 Markaasuu wuxuu ku yidhi, Gabadhaydiiyey, Rabbigu
ha ku barakeeyo, waayo, roonaan weyn baad i tustay ugu
dambaystii, oo ka sii weyn tii markii hore, maxaa yeelay,
ma aad raacin rag dhallinyaro ah, faqiir iyo taajir toona. 11
Haddaba, gabadhaydiiyey, ha cabsan; waayo, waan kuu
samayn doonaa wixii aad sheegtay oo dhan, maxaa yeelay,
dadka magaaladayda oo dhammu way wada og yihiin inaad
tahay naag wanaagsan. 12 Haddaba inaan anigu ahay
xigaal kuu dhow waa run, habase yeeshee waxaa jira nin
xigaal ah oo iiga kaa sii dhow. 13 Haddaba bal caawa
iska joog, oo subaxdana hadduu isagu kuu sameeyo waxa

xigaalka waajibka ku ah waa hagaag, ha sameeyo, laakiinse
haddaanu kuu yeelin waajibka xigaalka, de markaas Rabbiga
noloshiisaan kuugu dhaartaye, anaa kuu samaynaya. 14 Oo
iyana cagihiisay jiifsatay ilaa subaxdii, markaasay waxay
kacday intaan qof qof kale laga garan karin. Waayo, wuxuu
yidhi, Yaan la ogaanin in naagu timid meesha hadhuudhka
lagu tumo. 15 Oo wuxuu ku yidhi, Garbasaarta korkaaga
saaran bal keen, oo hoori, kolkaasay hoorisay; markaasuu
wuxuu ugu miisay lix koombo oo shaciir ah, wuuna u saaray;
oo isna magaaladuu galay. 16 Oo markay soddohdeed u
timid, Nimco waxay ku tidhi, Gabadhaydiiyey, tumaad tahay?
Markaasay waxay u sheegtay wixii ninku u sameeyey oo
dhan. 17 Oo waxay tidhi, Lixdatan koombo oo shaciirka ah
isagii baa i soo siiyey, waayo, wuxuu igu yidhi, Adoo faro
madhan soddohdaa ha u tegin. 18 Oo iyana markaasay tidhi,
Gabadhaydiiyey, iska fadhiiso ilaa aad ogaatid sida arrintu
u dhacayso, waayo, ninku nasan maayo ilaa uu maanta
xaalkaas dhammeeyo.

4 Markaasaa Bocas wuxuu tegey iriddii magaalada, oo
halkaasuu fadhiistay; oo bal eeg waxaa ag yimid ninkii
Bocas ka hadlay ee ahaa xigaalka uga dhow. Markaasuu
wuxuu ku yidhi, War, hebelow, soo leexo, oo bal kaalay,
halkan fadhiiso. Kolkaasuu soo leexday oo fadhiistay. 2
Markaasuu wuxuu soo kaxaystay toban nin oo odayaashii
magaalada ah, oo wuxuu ku yidhi, Bal halkan fadhiista,
oo iyana way fadhiisteen. 3 Markaasuu wuxuu ku yidhi
ninkii xigaalka u dhow ahaa, Nimco oo ka soo noqotay
waddankii reer Moo'aab ayaa iibinaysa jagadii dhulka ahayd
ee uu lahaa walaalkeen Eliimeleg. 4 Oo waxay ila noqotay
inaan ku ogeysiiyo inaad ku iibsato kuwa halkan fadhiya
iyo odayaasha dadkayga hortooda. Haddaad doonaysid
inaad iibsatid, iibso, laakiinse haddaanad doonaynin inaad
iibsatid ii sheeg aan ogaadee, waayo, nin kaaga dhow oo
iibsanaya ma jiro, oo anna adigaan kaa dambeeyaa. Isna
wuxuu yidhi, Waan iibsanayaa. 5 Markaasaa Bocas wuxuu
yidhi, Maalintii aad Nimco gacanteeda beerta ka iibsatid,
waa inaad Ruud tii reer Moo'aabna ka iibsataa, taasoo ah
naagtii kii dhintay, inaad kii dhintay magiciisii ku soo celisid
dhulkii dhaxalkiisa ahaa. 6 Markaasaa ninkii xigaalka u dhow
ahaa wuxuu yidhi, Anigu taas ma iibsan karo, waayo, waaba
intaasoo aan dhaxalkayga halleeyaa; haddaba adigu qaado
xaqii aan iibsashada u lahaa, maxaa yeelay, anigu ma aan
iibsan karo. 7 Oo haddaba waagii hore reer binu Israa'iil
dhexdooda caadadii ku saabsanayd kala iibsashada iyo kala
beddelashada waxay ahayd in nin kabtiisa iska siibo oo uu
deriskiisa u dhiibo in wax walba la sii adkeeyo aawadeed.
Taasu waxay reer binu Israa'iil u ahayd sida loo markhaati
furo. 8 Sidaas daraaddeed ninkii xigaalka u dhow ahaa
wuxuu Bocas ku yidhi, Adigu soo iibso. Markaasuu kabtiisii
iska siibay. 9 Markaasaa Bocas wuxuu ku yidhi odayaashii iyo
dadkii oo dhanba, Bal idinku maanta markhaatiyaal baad ka
tihiin inaan Nimco gacanteeda ka iibsaday kulli wixii Eliimeleg
lahaa oo dhan, iyo kulli wixii Kilyoon iyo Maxloon lahaayeen
oo dhan. 10 Oo weliba Ruud tii reer Moo'aab oo ahayd
naagtii Maxloonna waxaan u iibsaday inay naagtaydii ahaato
ee aan kii dhintay magiciisii u soo celiyo dhulkii uu dhaxalka
u lahaa, si uusan kii dhintay magiciisii uga go'in walaalihiis
dhexdooda iyo iriddii meeshiisa; idinku markhaatiyaal baad
ka tihiin. 11 Markaasaa dadkii iridda joogay oo dhan iyo
odayaashiiba waxay yidhaahdeen, Markhaatiyaal baannu
ka nahay. Naagta gurigaaga soo gashay Rabbigu ha ka
dhigo sidii Raaxeel iyo Lee'ah, labadaas oo ahaa kuwii
dhisay reerkii Israa'iil; oo adna Efraataah ku barwaaqow,
Beytlaxamna caan ku ahow. 12 Oo farcanka Rabbigu kaa
siin doono naagtan dhallintayar reerkaagu ha ku noqdo
sidii reerkii Feres, kaasoo ahaa kii Taamaar u dhashay
Yahuudah. 13 Markaasuu Bocas kaxaystay Ruud, oo iyana
waxay noqotay naagtiisii; kolkaasuu iyadii u tegey, oo
Rabbiguna wuxuu iyadii siiyey uur oo waxay dhashay wiil. 14
Markaasaa dumarkii waxay Nimco ku yidhaahdeen, Mahad
waxaa leh Rabbiga aan maanta xigaalla'aan ku dhigin, oo
magiciisuna reer binu Israa'iil caan ha ku dhex ahaado.
15 Oo isna wuxuu kuu noqon doonaa naf-sooceliye iyo ku
markaad gabowdo ku quudiya. Waayo, waxaa isaga kuu
dhashay gabadhii aad soddohda u ahayd ee ku jeclayd, ee
kaaga sii wanaagsan toddoba wiil. 16 Markaasaa Nimco
wiilkii qaadday oo laabta ku jiifisay, oo waxay u noqotay
tu xannaanaysa. 17 Markaasaa dumarkii deriska u ahaa
magac u bixiyeen, oo waxay yidhaahdeen, Wiil baa u
dhashay Nimco, oo magiciisiina waxay u bixiyeen Coobeed;
oo isagu waa Yesay aabbihiis, kii Daa'uud dhalay. 18
Haddaba kuwanu waa abtirsiinyadii Feres. Feres wuxuu
dhalay Xesroon; 19 Xesroonna wuxuu dhalay Raam, Raamna
wuxuu dhalay Cammiinaadaab; 20 Cammiinaadaabna wuxuu
dhalay Naxshoon, Naxshoonna wuxuu dhalay Salmoon; 21
Salmoonna wuxuu dhalay Bocas, Bocasna wuxuu dhalay
Coobeed; 22 Coobeedna wuxuu dhalay Yesay, Yesayna
wuxuu dhalay Daa'uud.

# Samuu'Eel Kowaad

**1** Waxaa jiray nin reer Raamaatayim Soofiim ahaa oo degganaa dalkii buuraha lahaa ee reer Efrayim, magiciisana waxaa la odhan jiray Elqaanaah, oo wuxuu ahaa ina Yeroxaam, ina Eliihuu, ina Toohuu, ina Suuf, wuxuuna ahaa reer Efraad; **2** oo wuxuu lahaa laba naagood, middood magaceeda waxaa la odhan jiray Xannaah, tan kale magaceeduna wuxuu ahaa Feninnaah. Feninnaah carruur bay lahayd, laakiinse Xannaah carruur ma lahayn. **3** Oo ninkaasu sannad ka sannad wuxuu ka bixi jiray magaaladiisa, oo wuxuu u tegi jiray inuu Rabbiga Ciidammada Shiiloh ku caabudo oo allabari u bixiyo. Oo Ceelii labadiisii wiil oo ahaa Hofnii iyo Fiinexaas, ee Rabbiga wadaaddo u ahaana halkaasay joogeen. **4** Oo Elqaanaah maalintii uu allabariga bixiyey ayuu qayb siiyey naagtiisii Feninnaah iyo wiilasheedii iyo gabdhaheedii oo dhan, **5** laakiinse Xannaah wuxuu siiyey qayb labanlaab ah; maxaa yeelay, Xannaah wuu jeclaa, laakiinse Rabbigaa maxalkeedii xidhay. **6** Tii dhibi jirtay ayaa aad uga cadhaysiisay, si ay uga xanaajiso, maxaa yeelay, Rabbigaa maxalkeedii xidhay. **7** Oo intuu saas yeelayay sannad ka sannad, markii ay gurigii Rabbiga tagtay, ayay ka xanaajisay iyadii, taas daraaddeed way ooyday, oo waxba ma ay cunin. **8** Markaasaa ninkeedii Elqaanaah wuxuu iyadii ku yidhi, Xannaah, maxaad u ooyaysaa? Oo maxaad wax u cuni weyday? Oo maxaa qalbigaagu u xumaaday? Miyaanan anigu toban wiil kaaga wanaagsanayn? **9** Saas aawadeed Xannaah way kacday markii ay Shiiloh wax ku cuneen oo ay wax cabbeen dabadeed. Haddaba wadaadkii Ceelii ahaa wuxuu ku fadhiistay kursigiisii oo ag yiil macbudka Ilaah tiirkiisa. **10** Iyadu aad bay u murugootay, oo intay ooyday ayay Rabbiga bariday. **11** Markaasay nidar nidartay, oo waxay tidhi, Rabbiga Ciidammadow, haddaad fiirisid dhibta aan anoo addoontaada ah qabo, oo aad i soo xusuusatid, ee aadan i illoobin anoo addoontaada ah, laakiinse aad i siiso wiil, de markaas cimrigiisa oo dhan waan ku siinayaa, Rabbiyow, oo madaxiisana mandiil lama marin doono. **12** Oo intii ay Rabbiga hortiisa ku baryootamaysay ayuu Ceelii fiiriyey afkeedii. **13** Haddaba Xannaah waxay ka hadlaysay qalbigeeda, oo bushimaheeda keliya ayaa dhaqdhaqaaqayay, laakiinse codkeedii lama maqlin; sidaas daraaddeed Ceelii wuxuu mooday inay sakhraantay. **14** Markaasaa Ceelii wuxuu iyadii ku yidhi, Ilaa gormaad sakhraamaysaa? Khamrigaaga iska fogee. **15** Markaasaa Xannaah u jawaabtay oo ku tidhi, Maya, sayidkaygiiyow, ee waxaan ahay naag ruuxeedu murugaysan yahay, oo ma aanan cabbin khamri iyo wax lagu sakhraamo toona, laakiinse naftaydaan Rabbiga ku baryayaa. **16** Anoo addoontaada ah ha igu tirin gabadh xun; waayo, welwelkayga iyo xanaaqayga batay aawadood ayaan ilaa haatan u hadlayay. **17** Markaasaa Ceelii u jawaabay oo yidhi, Nabad ku tag, oo Ilaaha reer binu Israa'iil ha ku siiyo baryadaadii aad weyddiisatay. **18** Markaasay tidhi, Anoo addoontaada ah naxariis aan kaa helo. Sidaas daraaddeed naagtii way iska tagtay, oo wax bay cuntay, oo wejigeeduna mar dambe ma murugsanayn. **19** Markaasay aroor hore kaceen, oo Rabbiga caabudeen, dabadeedna way noqdeen, oo yimaadeen gurigoodii Raamaah ku yiil; markaasaa Elqaanaah u tegey naagtiisii Xannaah; oo Rabbiguna iyadii wuu xusuustay. **20** Oo markii wakhtigii la gaadhay ayay Xannaah uuraysatay, oo ay wiil dhashay; oo magiciisiina waxay u bixisay Samuu'eel, oo waxay tidhi, Maxaa yeelay, isagaan Rabbiga weyddiistay. **21** Markaasaa ninkii Elqaanaah ahaa, iyo reerkiisii oo dhammuba waxay u tageen inay Rabbiga u bixiyaan allabarigii sannad walba joogtada u ahaa iyo nidarkiisii. **22** Laakiinse Xannaah ma ay tegin, waayo, waxay ninkeedii ku tidhi, Anigu tegi maayo ilaa wiilka naaska laga gudhiyo, dabadeedna waan keeni doonaa inuu Rabbiga hortiisa ka muuqdo, oo uu halkaas joogo weligiisba. **23** Markaasaa ninkeedii Elqaanaah ku yidhi, Wixii kula wanaagsan yeel; oo iska joog ilaa aad naaska ka gudhisid, laakiinse Rabbigu eraygiisa ha adkeeyo. Sidaas aawadeed naagtii way iska joogtay oo wiilkii bay nuujisay ilaa ay naaskii ka gudhisay. **24** Oo markay isagii naaska ka gudhisay ayay qaadatay oo la tagtay isagii, iyo saddex dibi, iyo eefaah bur ah, iyo qarbed khamri ah, oo waxay isagii keentay gurigii Rabbiga ee Shiiloh ku yiil, oo wiilkuna wuu yaraa. **25** Markaasay dibi qaleen, oo wiilkiina waxay u keeneen Ceelii. **26** Kolkaasay tidhi, Sayidkaygiiyow, waxaan ku dhaaranayaa naftaada nool, Sayidkaygiiyow, waxaan ahay naagtii halkan ku soo ag istaagtay, iyadoo Rabbiga baryaysa. **27** Waxaan ka baryay wiilkan, oo Rabbigu waa i siiyey baryadaydii aan weyddiistay isaga, **28** sidaas daraaddeed waxaan isaga siiyey Rabbiga, oo intuu nool yahay oo dhan waxaa leh oo la siiyey Rabbiga. Oo isna halkaasuu Rabbiga ku caabuday.

**2** Markaasaa Xannaah tukatay oo waxay tidhi: Qalbigaygu Ilaah buu ku faraxsan yahay, Geeskaygana Rabbigu kor buu u qaaday. Afkayguna wuxuu u faanaa cadaawayaashayda, Maxaa yeelay, waxaan ku reyreeyaa badbaadintaada. **2** Mid quduus ahu sida Rabbiga ma jiro, Waayo, adiga mooyee mid kale ma jiro, Oo dhagax weyn oo Ilaahayaga la mid ahuna ma jiro. **3** Hadal dambe oo saas u kibir badan ha ku hadlina; Afkiinna yaanu kibir ka soo bixin;

Waayo, Rabbigu waa Ilaah wax walba yaqaan, Falimahana
isagaa miisaama. **4** Raggii xoogga badnaa qaansooyinkoodii
waa jajaban yihiin, Oo kuwii kufkufayayna itaal bay guntan
yihiin. **5** Kuwii dhergi jiray waxay naftooda u kiraysteen
kibis aawadeed. Kuwii gaajaysnaana way gaajo baxeen,
Oo madhashadiina waxay dhashay toddoba, Oo tii carruur
badan lahaydna way taag gabtay. **6** Rabbigu wax buu dilaa,
wuuna soo nooleeyaa; Qabriguu wax geliyaa, wuuna ka soo
bixiyaa. **(Sheol h7585)** **7** Rabbigu isagaa wax masaakiin ka
dhiga, isagaana taajir ka dhiga. Wuu hoosaysiiyaa, wuuna
sarraysiiyaa haddana. **8** Oo miskiinka ciidduu ka kiciyaa,
Oo ka baahanna tuulmada digada ayuu kor uga qaadaa, Si
uu amiirrada ula fadhiisiyo, Oo ay carshiga ammaanta u
dhaxlaan; Waayo, tiirarka dhulka Rabbigaa leh, Oo dunidana
iyaguu saaray. **9** Kuwiisa quduuska ah cagahooda isagaa
dhawri doona, Laakiinse kuwa sharka leh waxaa lagu
aamusiin doonaa gudcur dhexdiis; Waayo, ninna xoog kuma
adkaan doono. **10** Kuwa Rabbiga la dirira waa la kala
jejebin doonaa; Oo iyaga samaduu kaga soo onkodi doonaa,
Rabbigu wuxuu xukumi doonaa darfaha dunida; Oo wuxuu
xoog u yeeli doonaa boqorkiisa, Oo wuxuu sarraysiin doonaa
geeska kiisa subkan. **11** Markaasaa Elqaanaah wuxuu tegey
Raamaah iyo xaggii gurigiisii. Oo wiilkiina wuxuu Rabbiga
uga adeegi jiray wadaadkii Ceelii hortiisa. **12** Haddaba Ceelii
wiilashiisii waxay ahaayeen wiilal waxmatarayaal ah, oo
Rabbiga ma ay aqoon. **13** Haddaba caadadii wadaaddadu
dadka la lahaayeen waxay ahayd, in markii nin uun allabari
bixiyo uu midiidinka wadaadku iman jiray, inta hilibka la
karinayo, isagoo gacanta ku sita hilibqabato saddex farood
leh, **14** oo wuxuu ku dhex mudi jiray daawihii, ama kidhligii,
ama digsigii, ama dherigii, oo kulli wixii qabatadu ay soo
qaaddoba wadaadku wuu qaadan jiray. Oo saasay reer
binu Israa'iilkii Shiiloh yimid oo dhan ku sameeyeen. **15** Oo
weliba intaan baruurta la gubin ayaa midiidinkii wadaadku
iman jiray, oo wuxuu ku odhan jiray ninkii alla baryayay,
Hilib wadaadka loo dubo keen, waayo, isagu kaa dooni
maayo hilib karsan, mid ceedhin ah mooyaane. **16** Oo haddii
ninku ku yidhaahdo, Marka hore baruurta hubaal waa la
gubayaa, dabadeedse intii naftaadu jeceshahay qaado;
markaas wuxuu ku odhan jiray, Maya, saas ma aha, laakiinse
haatan i sii, haddii kalese, xoog baan ku qaadan doonaa.
**17** Oo raggii dhallinyarada ahaa dembigoodii aad buu ugu
weynaa Rabbiga hortiisa; waayo, raggii waxay quudhsan
jireen qurbaankii Rabbiga. **18** Laakiinse Samuu'eel wuxuu
ka adeegi jiray Rabbiga hortiisa, isagoo wiil yar ah, ee
guntan eefod dhar wanaagsan laga sameeyey. **19** Oo weliba
hooyadiisna waxay u samayn jirtay khamiis yar, oo sannad
ka sannad ayay u keeni jirtay, markay ninkeeda soo raacdo
inay bixiyaan allabarigii sannadda. **20** Oo Ceeliina waa u
duceeyey Elqaanaah iyo afadiisiiba, oo wuxuu ku yidhi,
Daynkii Rabbiga la siiyey aawadiis Rabbigu naagtan farcan
ha kaa siiyo. Oo iyana waxay tageen xaggii gurigoodii. **21**
Oo Rabbigu waa soo booqday Xannaah, oo way uuraysatay,
oo waxay dhashay saddex wiil iyo laba gabdhood. Oo yarkii
Samuu'eel ahaana wuxuu ku koray Rabbiga hortiisa. **22** Oo
Ceeliina aad buu u gaboobay; oo wuxuuna maqlay wixii
ay wiilashiisu reer binu Israa'iil oo dhan ku sameeyeen, iyo
inay la seexdeen dumarkii ka adeegi jiray iridda teendhada
shirka. **23** Markaasuu wuxuu ku yidhi iyagii, War maxaad
waxyaalaha caynkaas ah u samaysaan? Waayo, waxaan
dadkan oo dhan ka maqlay macaamilooyinkiinna xunxun.
**24** Maya, wiilashaydiiyow, waayo, warkaan maqlay ma
wanaagsana, maxaa yeelay, idinku dadka Rabbiga waad
xadgudbisaan. **25** Haddii nin mid kale ku dembaabo, Ilaah
baa isaga xukumi doona, laakiinse nin hadduu Rabbiga ku
dembaabo, bal yaa isaga u baryootami doona? Laakiinse
iyagu ma ay dhegaysan codkii aabbahood, maxaa yeelay,
Rabbigu wuxuu doonayay inuu dilo iyaga. **26** Oo yarkii
Samuu'eel ahaana wuu sii koray, oo Rabbiga iyo dadkuba
raalli bay ka ahaayeen. **27** Markaasaa Ceelii waxaa u
yimid nin Ilaah, oo wuxuu ku yidhi isagii, Sidanaa Rabbigu
leeyahay, Reerkii aabbahaa miyaan isu muujiyey markay
Masar joogeen oo ay ku hoos jireen addoonsigii reerkii
Fircoon? **28** Oo miyaan isaga ka doortay qabiilooyinka reer
binu Israa'iil oo dhan inuu wadaad ii noqdo, iyo inuu ku
allabaryo meeshayda allabariga, iyo inuu uunsi shido, iyo
inuu hortayda eefod ku xidho? Oo miyaan reerkii aabbahaa
siiyey qurbaannadii reer binu Israa'iil oo dhan ee dab lagu
sameeyo? **29** War maxaad u quudhsataan allabarigayga iyo
qurbaankayga aan ku dhex amray rugtayda; oo maxaad
wiilashaada iiga murwad badisaa, ee aad naftiinna ugu
cayilisaan dadkayga reer binu Israa'iil qurbaannadooda oo
dhan inta ugu wanaagsan? **30** Sidaas daraaddeed Rabbiga
ah Ilaaha reer binu Israa'iil wuxuu leeyahay, Anigu waxaan
idhi, Hubaal reerkaaga iyo reerka aabbahaaba hortayday
ku socon doonaan weligood. Laakiinse haatan Rabbigu
wuxuu leeyahay, Taasu ha iga fogaato, waayo, kuwa i
murweeya waan murwayn doonaa, oo kuwa i quudhsadana
waa la fududaysan doonaa. **31** Bal eeg, waxaa iman doona
wakhtigii aan gooyn lahaa gacantaada iyo gacanta reerka
aabbahaaba si aan reerkaaga nin da' weyn looga helin. **32**
Oo waxaad arki doontaa dhibaatada rugtayda markii Ilaah
reer binu Israa'iil maal siiyo, oo reerkaaguna nin da' weyn ma
yeelan doono weligiisba. **33** Oo haddii la helo nin kaa ah ee

aanan meeshayda allabariga ka gooyn, kaasu indhahaaguu
gubi doonaa oo qalbigaaguu murugayn doonaa, oo dadkii
reerkaaga ka dhashaana dhallinyaronimada ayay ku dhiman
doonaan dhammaantood. 34 Oo tanu waxay kuu ahaan
doontaa calaamo, waana waxa ku dhici doona labadaada wiil
ee ah Hofnii iyo Fiinexaas, oo labadooduba isku maalin bay
dhiman doonaan. 35 Oo anigu waxaan kicin doonaa wadaad
aamin ah kaasoo samayn doona waxa ku jira qalbigayga
iyo maankayga; oo anna waxaan isaga u dhisi doonaa reer
ammaan ah, oo isna weligiis wuxuu ku hor socon doonaa
kayga subkan. 36 Oo waxaa dhici doona in kuwa reerkaaga
ka hadha oo dhammu ay u iman doonaan oo ku hor dhici
doonaan isaga, iyagoo ka tuugaya gogo' lacag ah iyo xabbad
kibis ah, oo waxay ku odhan doonaan, Waan ku baryayaaye,
hawsha wadaaddada middood i sii si aan u cuno xabbad
kibis ah.

**3** Oo yarkii Samuu'eel ahaana wuxuu Rabbiga uga adeegi
jiray Ceelii hortiisa. Oo wakhtigaasna erayga Rabbigu wax
aan marar badan la helin buu ahaa, oo muuqasho bayaan
ahna lama muujin. 2 Oo wakhtigaas markii Ceelii jiifsaday
meeshiisii, (haddaba indhihiisii way arag darnaayeen oo
waxba ma uu arki karin) 3 oo laambaddii Ilaahna aan weli la
demin, oo Samuu'eelna jiifsaday macbudkii Rabbiga, kaasoo
ah meeshii sanduuqa Ilaah yiil, 4 ayaa Rabbigu Samuu'eel
u yeedhay, oo isna wuxuu yidhi, Waa i kan. 5 Markaasuu
Ceelii ku orday, oo wuxuu ku yidhi, Waa i kan, waayo, waad ii
yeedhay. Kolkaasuu yidhi, Anigu kuuma aan yeedhin, ee iska
jiifso. Markaasuu tegey oo jiifsaday. 6 Markaasaa Rabbigu
haddana u yeedhay oo yidhi, Samuu'eelow. Kolkaasaa
Samuu'eel kacay oo Ceelii u tegey, oo wuxuu ku yidhi,
Waa i kan, waayo, waad ii yeedhay. Oo isna wuxuu ugu
jawaabay, Wiilkaygiiyow, kuuma aan yeedhin ee iska jiifso. 7
Haddaba Samuu'eel weli ma uu aqoon Rabbiga, oo welina
erayga Rabbiga looma muujin isaga. 8 Oo haddana Rabbigu
wuxuu Samuu'eel u yeedhay mar saddexaad. Oo isna wuu
kacay oo u tegey Ceelii, wuxuuna ku yidhi, Waa i kan;
waayo, waad ii yeedhay. Oo Ceeliina markaasuu gartay
in Rabbigu u yeedhay yarka. 9 Sidaas daraaddeed Ceelii
wuxuu Samuu'eel ku yidhi, Tag oo iska jiifso, oo waxay
ahaan doontaa, hadduu kuu yeedho inaad ku tidhaahdid,
Rabbiyow ila hadal, waayo anoo addoonkaaga ah waan ku
maqlayaaye. Sidaas aawadeed Samuu'eel waa tegey oo
meeshiisuu jiifsaday. 10 Markaasaa Rabbigu u yimid, oo
ag istaagay, oo sidii mararkii kale ayuu u yeedhay oo ku
yidhi, Samuu'eelow, Samuu'eelow. Markaasaa Samuu'eel
wuxuu yidhi, Ila hadal, waayo, anoo addoonkaaga ah waan
ku maqlayaaye. 11 Markaasaa Rabbigu Samuu'eel ku yidhi,
Bal eeg, waxaan reer binu Israa'iil ku dhex samaynayaa wax
ku alla kii maqlaaba uu ka nixi doono. 12 Oo maalintaas
waxaan Ceelii ku samayn doonaa kulli wixii aan reerkiisa
kaga hadlay oo dhan, ilaa bilowgii iyo xataa dhammaadka.
13 Waayo, waxaan isaga u sheegay inaan reerkiisa weligiis
u xukumayo dembigii uu ogaa, maxaa yeelay, wiilashiisii
inkaar bay isku rideen, oo isna kama uu joojin iyagii. 14
Sidaas daraaddeed waxaan reerka Ceelii ugu dhaartay inaan
reerka Ceelii weligiis dembigiisa lagu nadiifin doonin allabari
amase qurbaan. 15 Markaasaa Samuu'eel iska jiifsaday
ilaa subaxdii, oo dabadeedna wuxuu furay gurigii Rabbiga
albaabbadiisii. Oo Samuu'eelna waa ka cabsaday inuu
Ceelii muujintii u sheego. 16 Markaasaa Ceelii Samuu'eel
u yeedhay, oo ku yidhi, Wiilkaygii Samuu'eelow, oo isna
wuxuu yidhi, Waa i kan. 17 Markaasuu ku yidhi, Waxa
Rabbigu kuu sheegay waa maxay? Waan ku baryayaaye, ha
iga qarin. Ilaah ha kugu sameeyo waxaas iyo wax ka sii
daranba, haddii aad iga qarisid innaba wixii uu kuu sheegay
oo dhan. 18 Oo Samuu'eelna wuu u sheegay wax kasta, oo
waxba kama uu qarin innaba. Markaasuu yidhi, Isagu waa
Rabbiga, ee ha sameeyo wixii la wanaagsan isaga. 19 Oo
Samuu'eelna wuu koray, Rabbiguna waa la jiray isaga, oo
uma oggolaan in erayadiisii midna dhulka ku dhaco. 20 Oo
reer binu Israa'iil oo dhammuna tan iyo Daan iyo ilaa Bi'ir
Shebac way wada ogaayeen in Samuu'eel loo adkeeyey
inuu ahaado Rabbiga nebigiis. 21 Oo Rabbigu haddana
mar kale ayuu ka muuqday Shiiloh, waayo, Rabbiga ayaa
eraygiisii isugu muujiyey Samuu'eel oo Shiiloh jooga.

**4** Oo hadalkii Samuu'eelna wuxuu soo gaadhay reer binu
Israa'iil oo dhan. Oo reer binu Israa'iilna waxay u soo
baxeen inay reer Falastiin la diriraan, oo waxay soo ag
degeen Ebenceser; reer Falastiinna waxay soo degeen
Afeeq. 2 Oo reer Falastiinna waxay weerar isugu soo
diyaariyeen reer binu Israa'iil; oo markii ay dagaalkii isugu
yimaadeenna reer binu Israa'iil waa la jebiyey reer Falastiin
hortooda; oo waxay ciidankii berrinka joogay ka laayeen afar
kun oo nin. 3 Oo markay dadkii xeradii yimaadeen ayay
odayaashii reer binu Israa'iil yidhaahdeen, Maanta maxaa
Rabbigu inoogu laayay reer Falastiin hortooda? Haddaba
sanduuqii axdiga Rabbiga aynu Shiiloh ka soo qaadanno oo
dhexdeenna ha yimaado, inuu inaga badbaadiyo gacanta
cadaawayaasheenna. 4 Sidaas daraaddeed dadkii waxay u
cid direen Shiiloh, oo waxay halkaas ka keeneen sanduuqii
axdiga Rabbiga Ciidammada oo ku fadhiya Keruubiimta
dushooda, oo Ceelii labadiisii wiil oo ahaa Hofnii iyo Fiinexaas

iyana halkaasay la joogeen sanduuqa axdiga Ilaah. 5 Oo
markii sanduuqii axdiga Rabbigu soo galay xeradii ayaa reer
binu Israa'iil oo dhammu waxay ku qayliyeen qaylo weyn ee
dhulku la gariiray. 6 Oo reer Falastiinna markay maqleen
dhawaaqii qaylada ayay yidhaahdeen, Dhawaaqa qaylada
weyn ee xeradii Cibraaniyadii ka baxaya micnihiisu waa
maxay? Markaasay garteen inuu sanduuqii Rabbigu xeradii
dhex yimid. 7 Oo reer Falastiinna way cabsadeen, oo waxay
yidhaahdeen, Ilaah baa xeradii soo galay. Oo haddana
waxay yidhaahdeen, Hoog baa inagu dhacay! Waayo, hadda
ka hor waxan oo kale lama arag. 8 Hoog baa inagu dhacaye!
Bal yaa inaga samatabbixin doona ilaahyadan xoogga weyn
gacantooda? Kuwanu waa ilaahyadii Masriyiinta ku laayay
cidlada ee ku soo daayay belaayooyin cayn kasta ah. 9 Reer
Falastiinow, xoog yeesha, oo raganimo isgeliya, yeydnan
Cibraaniyada addoommo u noqone, sidii ay idiinku ahaayeen
oo kale. Haddaba raganimo isgeliya oo dirira. 10 Markaasay
reer Falastiin dirireen, reer binu Israa'iilna waa la jebiyey,
oo midkood waliba wuxuu ku cararay teendhadiisii. Oo
maalintaas waxaa la laayay dad aad u badan; waayo,
reer binu Israa'iil waxaa ka le'day soddon kun oo nin oo
lug ah. 11 Oo sanduuqii Ilaahna waa la qaatay; oo Ceelii
labadiisii wiil oo ahaa Hofnii iyo Fiinexaasna waa la dilay.
12 Oo ciidankii waxaa ka orday nin reer Benyaamiin ah,
oo isla maalintiiba wuxuu yimid Shiiloh isagoo dharkiisu
jeexjeexan yahay, oo madaxana ciid ku leh. 13 Oo markuu
yimid, bal eeg, Ceelii wuxuu ku fadhiyey kursigiisii waddada
dhankeeda yiil, isagoo wax fiirinaya; waayo, qalbigiisu wuxuu
u dhibbanaa sanduuqii Ilaah aawadiis. Oo markii ninkii soo
galay magaaladii, oo uu u warramay, ayaa magaaladii oo
dhammu qaylisay. 14 Oo Ceeliina markuu maqlay dhawaaqii
qaylada ayuu yidhi, Buuqan sawaxankiisu waa maxay
micnihiisu? Markaasaa ninkii intuu soo dhaqsaday ayuu
Ceelii u yimid oo u warramay. 15 Ceeliina wuxuu jiray
siddeed iyo sagaashan sannadood, oo indhihiisuna dem bay
ahaayeen oo waxba ma uu arki karin. 16 Oo ninkii wuxuu
Ceelii ku yidhi, Anigu waxaan ahay kii ciidankii ka soo baxay,
oo maantaan ciidankii ka soo cararay. Markaasuu yidhi,
Wiilkaygiiyow, sidee bay xaaladdu u dhacday? 17 Oo kii
warka keenay waa jawaabay oo yidhi, Reer binu Israa'iil
way ka carareen reer Falastiin, oo dad badan baa la laayay,
oo labadaadii wiil oo ahaa Hofnii iyo Fiinexaas iyana way
dhinteen, oo sanduuqii Ilaahna waa la qaatay. 18 Oo markuu
sanduuqii Ilaah wax uga sheegay, ayuu Ceelii dib uga dhacay
kursigiisii iridda ag yiil, markaasuu qoorta ka jabay oo dhintay,
waayo, wuxuu ahaa nin da' weyn oo culus. Oo wuxuu reer
binu Israa'iil xukumi jiray afartan sannadood. 19 Oo gabadhii
uu soddogga u ahaa ee Fiinexaas qabay, uur bay lahayd oo
fool bay ku dhowayd; oo markay maqashay warkii ahaa in
sanduuqii Ilaah la qaatay, oo ay soddoggeed iyo ninkeediiba
dhinteen ayay foororsatay oo umushay; waayo, haddiiba fool
baa qabatay. 20 Oo markay sakaraadaysay ayay naagihii
agteeda taagnaa ku yidhaahdeen, Ha baqin, waayo, waxaad
dhashay wiil. Laakiinse uma ay jawaabin, oo danna kama
gelin. 21 Oo iyana waxay wiilkii u bixisay Iikabood, oo tidhi,
Reer binu Israa'iil ammaantii way ka tagtay; maxaa yeelay,
sanduuqii Ilaah waa la qaatay, oo weliba soddoggeed iyo
ninkeediiba way dhinteen. 22 Oo waxay tidhi, Reer binu
Israa'iil ammaantii way ka tagtay; maxaa yeelay, sanduuqii
Ilaah waa la qaatay.

5 Haddaba reer Falastiin way qaateen sanduuqii Ilaah, oo
waxay ka keeneen Ebenceser, oo geeyeen Ashdood. 2
Markaasay reer Falastiin sanduuqii Ilaah qaateen, oo intay
geliyeen gurigii Daagoon ayay ag qotomiyeen Daagoon. 3
Oo maalintii dambe markii kuwii reer Ashdood aroor hore
kaceen waxay arkeen Daagoon oo wejiga ugu dhacay
sanduuqii Rabbiga hortiisa. Markaasay Daagoon qaadeen
oo meeshiisii qotomiyeen. 4 Oo haddana markay subaxdii
dambe aroor hore kaceen, waxay arkeen Daagoon oo
wejiga ugu dhacay sanduuqii Rabbiga hortiisa; oo Daagoon
madaxiisii iyo labadiisii gacmoodba way ka go'naayeen
oo waxay ku dhaceen marinka, oo Daagoon waxaa u
hadhay gumudkii oo keliya. 5 Taas aawadeed Daagoon
wadaaddadiisii, ama dad kaleto oo Daagoon gurigiisa soo
galaba, midna kuma joogsado marinkii guriga Daagoon
oo Ashdood ku yiil ilaa maantadan la joogo. 6 Laakiinse
gacantii Rabbigu way ku cuslayd reer Ashdood, wuuna
baabbi'iyey iyagii, oo wuxuu kasoobaxyo ku soo daayay
Ashdood iyo xuduudkeeda oo dhanba. 7 Oo dadkii reer
Ashdood markay arkeen inay saas tahay ayay yidhaahdeen,
Sanduuqa Ilaaha reer binu Israa'iil waa inaanu ina dhex
oollin; waayo, gacantiisii aad bay inoogu adag tahay, innaga
iyo ilaaheenna Daagoonba. 8 Sidaas daraaddeed waxay u
cid dirteen oo soo urursadeen madaxdii reer Falastiin oo
dhan, oo waxay yidhaahdeen, War maxaynu ku samaynaa
sanduuqa Ilaaha reer binu Israa'iil? Oo iyana waxay ugu
jawaabeen, Sanduuqii Ilaaha reer binu Israa'iil ha lagu soo
wareejiyo Gad. Oo iyana sanduuqii Ilaaha reer binu Israa'iil
halkaasay ku soo wareejiyeen. 9 Oo sidaasay ahaatay
markii ay qaadeen dabadeed inay gacantii Rabbigu gees
ka ahayd magaaladii, oo wuxuu ku riday naxdin weyn; oo
dadkii magaaladana wax buu ku dhuftay yar iyo weynba,
oo kulligoodna kasoobaxyo ayaa ka soo wada baxay. 10

Sidaas daraaddeed waxay sanduuqii Ilaah u direen xagga
Ceqroon. Oo markii sanduuqii Ilaah Ceqroon yimid ayay
reer Ceqroon wada qayliyeen, oo yidhaahdeen, Sanduuqa
Ilaaha reer binu Israa'iil waxay inoogu keeneen inay ina
laayaan innaga iyo dadkeennaba. 11 Sidaas daraaddeed
way u cid dirteen oo soo wada urursadeen madaxdii reer
Falastiin oo dhan, oo waxay ku yidhaahdeen, Sanduuqa
Ilaaha reer binu Israa'iil inaga fogeeya, oo iska daaya,
meeshiisii haddana ha tagee, oo innaga iyo dadkeennaba
yuu ina layne; waayo, magaalada waxaa kulligeed ku dhex
jiray naxdinta dhimashada, oo halkaasna gacanta Ilaah waa
ku cuslayd. 12 Oo dadkii aan dhimanna waxaa lagu dhuftay
kasoobaxyo, oo magaalada qayladeediina waxay u baxday
xagga samada.

**6** Oo sanduuqii Rabbiguna wuxuu waddankii reer Falastiin
yiil toddoba bilood. 2 Markaas reer Falastiin waxay
u yeedheen wadaaddadii iyo kuwii wax sheegi jiray, oo
waxay ku yidhaahdeen, Sanduuqa Rabbiga maxaannu ku
samaynaa? Bal noo sheega waxaannu ugu dirno meeshiisii.
3 Kolkaasay iyana waxay yidhaahdeen, Haddaad diraysaan
sanduuqa Ilaaha reer binu Israa'iil, isagoo madhan ha
dirina; laakiinse si walba qurbaan xadgudub u celiya; oo
dabadeedna waad bogsan doontaan, oo waxaad ogaan
doontaan sababta gacantiisu idinkaga dhaqaaqi weyday.
4 Oo markaasay yidhaahdeen, Qurbaanka xadgudubka
ee aannu u celin doonaa muxuu noqon doonaa? Oo
iyana waxay yidhaahdeen, Madaxda reer Falastiin inta
tiradoodu tahay oo dhammu ha bixiyeen shan kasoobax
oo dahab ah, iyo shan jiir oo dahab ah; waayo, idinka
iyo madaxdiinnaba isku belaayaa idinku wada dhacday.
5 Haddaba sidaas daraaddeed waa inaad samaysaan
kasoobaxyadiinnii taswiirtooda, iyo jiirarkii dalkiinna kharribay
taswiirtood; oo waa inaad ammaantaan Ilaaha reer binu
Israa'iil; waayo, waxaa suurtowda inuu gacantiisa idinka
qaado, idinka, iyo ilaahyadiinna, iyo dalkiinnaba. 6 Haddaba
maxaad qalbiyadiinna ugu adkaynaysaan sidii Masriyiintii iyo
Fircoon qalbiyadooda u adkeeyeen oo kale? Oo markii uu
cajaa'ibka weyn dhexdooda ku sameeyey, miyaanay dadkii
sii dayn inay tagaan oo miyaanay ambabbixin? 7 Haddaba
sidaas daraaddeed qaata oo diyaariya gaadhi cusub, iyo
laba sac oo irmaan ee aan weligood harqood la saarin, oo
sacaha gaadhiga ku xidha, weylahoodana ka soo celiya
oo guriga keena; 8 markaas qaada sanduuqa Rabbiga
oo saara gaadhiga, oo dahabka aad ugu celinaysaan
qurbaankii xadgudubka aawadiisna intaad sanduuq ku
riddaan dhinaciisa saara, oo markaas iska dira ha tagee.
9 Oo bal eega, haddii uu aado xagga xuduudkiisa iyo ilaa
Beytshemesh, de markaas isagaa xumaantan weyn inagu
sameeyey; haddii kalese waxaannu ogaanaynaa inaanay
gacantiisii ahayn waxa ina laayay, ee uu ahaa wax iskaga
keen dhacay. 10 Oo dadkiina sidii bay yeeleen, oo waxay soo
wateen laba sac oo irmaan, oo waxay ku xidheen gaadhigii,
oo weylahoodiina waxay ku xereeyeen guriga; 11 oo
sanduuqii Rabbiga iyo sanduuqii ay ku jireen jiirarkii dahabka
ahaa iyo taswiirtii kasoobaxyada waxay saareen gaadhigii.
12 Sacihiina waxay qaadeen jidkii toosnaa oo Beytshemesh,
oo waxay tageen xagga jidkii weynaa iyagoo sii bunaaxinaya
intii ay sii socdeen, oo midig iyo bidix toona uma ay
leexan, oo madaxdii reer Falastiinna way daba socdeen ilaa
soohdintii Beytshemesh. 13 Oo kuwii reer Beytshemeshna
waxay dooxada ka goosanayeen sarreenkoodii; oo intay
indhahoodii kor u qaadeen ayay arkeen sanduuqii, oo way
ku reyreeyeen inay arkaan. 14 Oo gaadhigiina wuxuu soo
galay beertii Yashuuca kii reer Beytshemesh, oo wuxuu
istaagay meel dhagax weynu ku yiil; oo intay qoryihii
gaadhiga jeexjeexeen ayay sacihiina Rabbiga ugu bixiyeen
qurbaan la gubo aawadiis. 15 Markaasay kuwii reer Laawi
soo dejiyeen sanduuqii Rabbiga, iyo sanduuqii isaga la
jirayba ee alaabta dahabka ahu ku jirtay, oo waxay kor
saareen dhagaxii weynaa; oo isla maalintaas ayaa dadkii
reer Beytshemesh Rabbiga u bixiyeen qurbaanno la gubo iyo
allabaryo. 16 Oo shantii madaxda ahayd oo reer Falastiinna
markay arkeen ayay isla maalintaas Ceqroon ku noqdeen.
17 Oo kuwanu waa kasoobaxyadii dahabka ahaa ee reer
Falastiin Rabbiga ugu celiyeen qurbaan xadgudub aawadiis;
Ashdood aawadeed mid baa loo celiyey, Gaasa aawadeedna
mid, Ashqeloon aawadeedna mid, Gad aawadeedna mid,
Ceqroon aawadeedna mid; 18 oo jiirarkii dahabka ahaana
waxay tiro le'ekaayeen magaalooyinkii reer Falastiin oo
shantii madaxda ahayd lahaayeen oo dhan, oo waa laga
wada bixiyey magaalooyinkii deyrka lahaa iyo tuulooyinkii
duurka ku yiilba iyo ilaa xataa dhagaxii weynaa ee ay dul
saareen sanduuqii Rabbiga, kaasoo xataa ilaa maantadan la
joogo dhex yaal beertii Yashuuca kii reer Beytshemesh. 19
Oo isna wuu laayay dadkii Beytshemesh, maxaa yeelay,
waxay dhugteen sanduuqii Rabbiga gudihiisa, oo wuxuu
dadkii ka laayay konton kun iyo toddobaatan nin, oo dadkiina
way baroorteen, maxaa yeelay, Rabbigu wuxuu laayay dad
aad u badan. 20 Markaasaa dadkii Beytshemesh waxay
yidhaahdeen, Bal yaa awooda inuu hor istaago Rabbiga
ah Ilaahan quduuska ah? Oo bal yuu nooga tegayaa? 21
Oo waxay wargeeysyo u direen dadkii degganaa Qiryad
Yecaariim, oo waxayna ku yidhaahdeen, Reer Falastiin

haddana way soo celiyeen sanduuqii Rabbiga, haddaba idinku kaalaya oo qaata.

7 Markaasaa waxaa yimid dadkii reer Qiryad Yecaariim, oo waxay qaateen sanduuqii Rabbiga, oo waxay soo geliyeen gurigii Abiinaadaab ee buurta ku yiil, oo waxay quduus ka dhigeen wiilkiisii Elecaasaar inuu hayo sanduuqii Rabbiga. 2 Oo ilaa maalintii sanduuqu yiil Qiryad Yecaariim wakhtigu waa dheeraa, maxaa yeelay, waxay ahayd labaatan sannadood, oo reer binu Israa'iil oo dhammuna Rabbiga ayay ka daba barooran jireen. 3 Markaasaa Samuu'eel wuxuu la hadlay reer binu Israa'iil oo dhan, oo wuxuu ku yidhi, Haddaad qalbigiinna oo dhan Rabbiga ugu soo noqotaan, de haddaba dhexdiinna ka fogeeya ilaahyada qalaad iyo Cashtarod, oo qalbiyadiinna u diyaariya Rabbiga oo keligiis u adeega; oo isna wuu idinka samatabbixin doonaa gacanta reer Falastiin. 4 Markaasaa reer binu Israa'iil iska fogeeyeen Bacaliim iyo Cashtarod, oo waxay u adeegeen Rabbiga keliya. 5 Markaasaa Samuu'eel wuxuu yidhi, Reer binu Israa'iil oo dhan Misfaah ku soo wada ururiya, oo anna Rabbigaan idiin baryayaa. 6 Markaasay dhammaantood Misfaah ku soo wada urureen, oo intay biyo soo dhaamiyeen ayay Rabbiga hortiisa ku shubeen, oo maalintaasna way soomeen, oo waxay halkaas ku yidhaahdeen, Annagu waxaannu ku dembaabnay Rabbiga. Oo Samuu'eelna wuxuu reer binu Israa'iil ku xukumi jiray Misfaah. 7 Oo reer Falastiinna markay maqleen in reer binu Israa'iil Misfaah ku ururasan yihiin ayaa madaxdii reer Falastiin u kaceen inay ku soo duulaan reer binu Israa'iil. Oo reer binu Israa'iilna markay taas maqleen ayay aad uga cabsadeen reer Falastiin. 8 Oo reer binu Israa'iilna waxay Samuu'eel ku yidhaahdeen, Ha joojin inaad noo baridid Rabbiga Ilaaheenna ahu inuu naga badbaadiyo gacanta reer Falastiin. 9 Markaasaa Samuu'eel soo kaxaystay wan yar oo caanonuug ah oo wuxuu Rabbiga ugu bixiyey allabari la gubo dhammaantiis; markaasaa Samuu'eel Rabbiga u baryay reer binu Israa'iil aawadood; oo Rabbiguna wuu ka aqbalay Samuu'eel. 10 Oo intii Samuu'eel allabariga la gubo bixinayay ayaa reer Falastiin soo dhowaadeen inay la diriraan reer binu Israa'iil; laakiinse Rabbigu maalintaas wuxuu reer Falastiin ku soo daayay onkod weyn, wuuna baabbi'iyey, oo reer binu Israa'iil hortooday ku jabeen. 11 Kolkaasay raggii reer binu Israa'iil intay Misfaah ka soo baxeen reer Falastiin eryadeen, wayna laynayeen ilaa ay Beytkaar hoosteeda yimaadeen. 12 Markaasaa Samuu'eel dhagax qaaday oo qotomiyey Misfaah iyo Sheen dhexdooda, oo wuxuu magiciisiina u bixiyey Ebenceser, oo yidhi, Ilaa haatan Rabbigu waa ina caawiyey. 13 Sidaas daraaddeed reer Falastiin waa la hoosaysiiyey, oo mar dambena sooma ay gelin xuduudkii reer binu Israa'iil; oo intii Samuu'eel noolaa oo dhan gacanta Rabbigu gees bay ka ahayd reer Falastiin. 14 Oo magaalooyinkii reer Falastiin ay ka qabsadeen reer binu Israa'iil waa loo soo celiyey reer binu Israa'iil, oo waxay ahaayeen Ceqroon iyo xataa tan iyo Gad; oo xuduudkeedii reer binu Israa'iil waa kala soo baxeen gacantii reer Falastiin. Oo reer binu Israa'iil iyo reer Amorna nabad baa u dhexaysay. 15 Oo Samuu'eelna wuxuu reer binu Israa'iil xukumi jiray intuu noolaa oo dhan. 16 Oo sannad kastaba wuxuu ku soo wareegi jiray Beytel, iyo Gilgaal, iyo Misfaah, oo meelahaas oo dhanna reer binu Israa'iil buu ku xukumi jiray. 17 Oo wuxuu ku noqon jiray Raamaah, waayo, halkaasuu gurigiisu ahaa, oo halkaasna reer binu Israa'iil buu ku xukumi jiray; oo halkaasna wuxuu Rabbiga uga dhisay meel allabari.

8 Oo markii Samuu'eel gaboobay ayuu wiilashiisii xaakinno uga dhigay reer binu Israa'iil. 2 Oo wiilkiisa curadka ahaa magiciisu wuxuu ahaa Yoo'eel, wiilkiisii labaadna magiciisu wuxuu ahaa Abiiyaah; oo waxay xaakinno ka ahaayeen Bi'ir Shebac. 3 Oo wiilashiisiina kuma ay socon jidadkiisii, laakiinse waxay u leexdeen si ay faa'iido u helaan, oo intay laaluush qaateen ayay gartii qallooociyeen. 4 Markaasaa odayaashii reer binu Israa'iil oo dhammu isa soo urursadeen, oo Samuu'eel ugu yimaadeen Raamaah; 5 oo waxay ku yidhaahdeen, Bal eeg, waad gabowday, oo wiilashaaduna kuma socdaan jidadkaagii; haddaba noo yeel boqor na xukuma sida quruumaha kale oo dhan. 6 Laakiinse waxaasu Samuu'eel way la xumaayeen, markii ay ku yidhaahdeen, Na sii boqor na xukuma. Markaasaa Samuu'eel Rabbiga baryay. 7 Oo Rabbiguna wuxuu Samuu'eel ku yidhi, Bal dhegayso codka dadka iyo kulli waxa ay ku leeyihiin oo dhan, waayo, adiga kuma ay diidin, laakiinse anay i diideen, inaanan iyaga u ahaan boqor. 8 Siday hore u yeeleen tan iyo maalintii aan ka soo bixiyey Masar iyo ilaa maantadan, taasoo ahayd inay iga tageen, oo ilaahyo kale u adeegeen, saasay adigana kugu samaynayaan. 9 Haddaba sidaas daraaddeed bal codkooda dhegayso, habase yeeshee waa inaad aad ugu markhaati furtaa, oo waa inaad u sheegtaa boqorka xukumi doona siduu ahaan doono. 10 Oo Samuu'eelna wuxuu erayadii Rabbiga oo dhan u sheegay dadkii boqorka weyddiistay. 11 Markaasuu wuxuu ku yidhi, Boqorka idin xukumayaa wuxuu ahaanayaa sidan: wuxuu idinka qaadan doonaa wiilashiinna, oo wuxuu ka dhigan doonaa kuwa gaadhifardoodka u wada, iyo fardooleydiisa, oo iyana waxay hor ordi doonaan gaadhifardoodkiisa. 12

Haddana wuxuu iyaga ka dhigan doonaa saraakiil kun
kun u sarreeya iyo saraakiil konton konton u sarreeya, oo
qaarna beerihiisay u fali doonaan, oo u gooyn doonaan, oo
waxay u samayn doonaan alaabta dagaalka, iyo alaabta
gaadhifardoodkiisa. 13 Oo gabdhihiinnana wuu idinka qaadan
doonaa oo wuxuu ka dhigan doonaa kuwo uunsiga sameeya,
iyo kuwo cuntada kariya, iyo kuwo kibista duba. 14 Oo wuxuu
idinka qaadan doonaa beerihiinna, iyo beerihiinna canabka
ah, iyo beerihiinna saytuunka ah, iyo xataa meelaha ugu
wada wanaagsan, oo wuxuu siin doonaa midiidinnadiisa. 15
Oo wuxuu idinka qaadan doonaa iniinihiinna toban meelood
oo meel iyo beerihiinna canabka ah, markaasuu siin doonaa
saraakiishiisa, iyo midiidinnadiisa. 16 Oo haddana wuxuu
idinka qaadan doonaa raggiinna addoommada idiin ah,
iyo gabdhaha addoommaha idiin ah, iyo dhallinyaradiinna
ragga ugu wanaagsan, iyo dameerihiinna, markaasuu ku
shaqaysan doonaa. 17 Oo wuxuu idinka qaadan doonaa
adhigiinna toban meelood oo meel, oo idinna waxaad
noqon doontaan addoommadiisa. 18 Oo maalintaas waxaad
ka qaylin doontaan boqorkiinna aad idinku doorateen oo
Rabbiguna idiin jawaabi maayo maalintaas. 19 Laakiinse
dadkii way diideen inay dhegaystaan Samuu'eel codkiisii, oo
waxay yidhaahdeen, Maya, laakiinse waxaannu yeelanaynaa
boqor noo taliya; 20 si aannu ula mid noqonno quruumaha
kale oo dhan; oo uu boqorkayagu noogu taliyo, oo uu noo hor
kaco oo noo dagaallamo wakhtiga dirirta. 21 Oo Samuu'eelna
wuu maqlay erayadii dadka oo dhan, oo haddana wuxuu
maqashiiyey dhegihii Rabbiga. 22 Markaasaa Rabbigu
wuxuu Samuu'eel ku yidhi, Codkooda maqal oo boqor u yeel
iyaga. Markaasaa Samuu'eel wuxuu dadkii reer binu Israa'iil
ku yidhi, Taga oo ninkiin waluba magaaladiisii ha tago.

**9** Haddaba waxaa jiray nin reer Benyaamiin ah, oo
magiciisana waxaa la odhan jiray Qiish, oo wuxuu ahaa
ina Abii'eel, ina Seroor, ina Bekoorad, ina Afiyax, oo reer
Benyaamiin ah, kaasoo ahaa nin xoog leh oo geesi ah. 2 Oo
isna wuxuu lahaa wiil la yidhaahdo Saa'uul, oo ahaa nin
dhallinyar oo wanaagsan. Oo reer binu Israa'iilna kuma jirin
qof isaga ka wanaagsan. Garbihiisa iyo waxa ka sarreeyaaba
way ka dheeraayeen dadka kale oo dhan. 3 Qiish oo ahaa
Saa'uul aabbihiis ayaa dameerihiisii ka lumeen. Markaasaa
Qiish wuxuu wiilkiisii Saa'uul ku yidhi, midiidinnada midkood
kaxee, oo kac, oo dameerihii doondoon. 4 Markaasuu
dhex maray dalkii buuraha lahaa oo reer Efrayim, oo
haddana wuxuu dhex maray dalkii reer Shaalishaah, laakiinse
dameerihii ma ay helin. Markaasay haddana dhex mareen
dalkii reer Shacaliim, oo halkaasna ma ay joogin. Oo
haddana wuxuu dhex maray dalkii reer Benyaamiin, laakiinse
halkaasna kama ay helin. 5 Oo markay yimaadeen dalkii
reer Suuf, Saa'uul wuxuu midiidinkiisii la socday ku yidhi,
Ina keen aan noqonnee, waayo, waaba intaasoo aabbahay
dameerihii ka hawo go'aa oo innaga inaga fikiraaye. 6 Oo
isna wuxuu ku yidhi, Bal eeg, magaaladan waxaa jooga
nin Ilaah, oo isna waxaa weeyaan nin aad loo ciseeyo, oo
wax alla wixii uu yidhaahdaaba run bay noqdaan, haddaba
bal ina keen aynu u tagnee; mindhaa wax waa inooga
sheegi karaa jidka aan mari doonno. 7 Markaasaa Saa'uul
wuxuu midiidinkiisii ku yidhi, War haddaynu u tagno maxaan
u geeynaa ninka? Waayo, kibistii weelasheenna waa ka
dhammaatay, oo ma hayno hadiyad aan u geeyno ninka
Ilaah. Bal maxaynu haysannaa? 8 Markaasaa midiidinkii
mar kale u jawaabay Saa'uul, oo ku yidhi, Bal eeg, gacanta
waxaan ku hayaa rubuc sheqel lacag ah, haddaba kaasaan
ninka Ilaah siinayaa inuu jidkeenna inoo sheego aawadeed.
9 (Waagii hore reer binu Israa'iil dhexdooda markii nin Ilaah
wax weyddiisanayo, sidan buu odhan jiray, Ina keena aan
wax arkaha u tagnee, waayo, haatan kan la yidhaahdo, Nebi,
waagii hore waxaa la odhan jiray, Wax arke.) 10 Markaasaa
Saa'uul wuxuu midiidinkiisii ku yidhi, Wax wanaagsan baad
tidhi, haddaba ina keen aan tagnee. Sidaas daraaddeed
waxay galeen magaaladii ninka Ilaah joogay. 11 Oo markay
soo fuulayeen jiirtii magaalada waxay la kulmeen gabdho
aroor u soo baxaya, kolkaasay ku yidhaahdeen, Wax arkihii
halkan ma joogaa? 12 Oo markaasay ugu jawaabeen, Wuu
joogaa, oo wuu idinka horreeyaa, haddaba dhaqsada, waayo,
isagu maantuu magaalada yimid, maxaa yeelay, dadku
maantay allabari ku bixinayaan meesha sare. 13 Oo markaad
magaalada gashaan, isla markaasba waad helaysaan isaga
intuusan meesha sare tegin inuu wax ku cuno, waayo, dadku
wax cuni maayaan ilaa uu yimaado, maxaa yeelay, isagaa
allabariga ku duceeya; dabadeedna kuwii loo yeedhay way
cunaan. Haddaba sidaas daraaddeed kaca, waayo, hadda
waad helaysaan isagii. 14 Markaasay magaaladii u kaceen,
oo markay magaaladii soo galeen, bal eeg, waxaa iyagii
ka soo hor baxay Samuu'eel oo u socda meeshii sare. 15
Haddaba Rabbigu wax buu Samuu'eel u muujiyey maalin ka
horraysay intaan Saa'uul iman, oo wuxuu ku yidhi, 16 Berri
haddaa oo kale waxaan kuu soo dirayaa nin ka yimid dalka
reer Benyaamiin, haddaba waa inaad isaga subagtaa inuu
amiir u ahaado dadkayga reer binu Israa'iil, oo isna wuxuu
dadkayga ka badbaadin doonaa gacanta reer Falastiin,
waayo, anigu waxaan soo dhugtay dadkayga, maxaa yeelay,
oohintoodii baa i soo gaadhay. 17 Oo Samuu'eelna wuxuu
arkay Saa'uul, Rabbiguna wuxuu isaga ku yidhi, Bal eeg, waa

kaas ninkii aan kuu sheegay! Kan qudhiisa ayaa dadkayga
u talin doona. **18** Markaasaa Saa'uul u soo dhowaaday
Samuu'eel oo iridda jooga, oo wuxuu ku yidhi, Waan ku
baryayaaye, ii sheeg wax arkaha gurigiisu meeshuu yahay.
**19** Oo Samuu'eelna wuu u jawaabay Saa'uul oo ku yidhi,
Wax arkuhu waa aniga, meesha sare hortay taga, waayo,
idinku maanta anigaad wax ila cunaysaan, oo subaxdiina
waan ku dirayaa, oo kulli waxa qalbigaaga ku jira oo dhanna
waan kuu sheegi doonaa. **20** Oo dameerahaaga saddex
maalmood hortood kaa lumayna ha ka fikirin innaba, waayo,
waa la helay. Bal yaa reer binu Israa'iil dhexdooda laga
wada jeclaadaa? Sow ma aha adiga iyo reerka aabbahaa
oo dhanba? **21** Markaasaa Saa'uul u jawaabay oo ku
yidhi, War sow anigu ma ahi reer Benyaamiin oo u wada
yar qabiilooyinka reer binu Israa'iil? Oo weliba jilibkaygu
sow ugama sii yara qabiilka reer Benyaamiin jilibyadiisa?
Haddaba maxaad sidan iigula hadlaysaa? **22** Markaasaa
Samuu'eel wuxuu kexeeyey Saa'uul iyo midiidinkiisii, oo
wuxuu keenay qolkii martida, wuxuuna fadhiisiyey kuwii loo
yeedhay dhexdooda meeshii ugu wacnayd, oo kuwii loo
yeedhayna waxay ahaayeen in soddon qof ku dhow. **23**
Markaasaa Samuu'eel wuxuu cuntokariyihii ku yidhi, Qaybtii
aan kuu dhiibay ee aan kugu idhi, Adigu ii hay, bal la kaalay.
**24** Markaasaa cuntokariyihii wuxuu soo qaaday garabkii iyo
wixii ku yiilba, oo wuxuu hor dhigay Saa'uul. Oo Samuu'eelna
wuxuu yidhi, Bal eeg wixii laguu kaydiyey, haddaba hortaada
dhigo oo cun, waayo, waa laguu hayay ilaa wakhtigii la
qawimay, oo anigu waxaan idhi, Dadka waan marti qaaday.
Markaasuu Saa'uul maalintaas wax la cunay Samuu'eel. **25**
Oo markay ka soo degeen meeshii sare, oo ay magaaladii
soo galeen, wuxuu Saa'uul kula sheekaystay guri dushiis. **26**
Oo waxay kaceen aroor hore, oo markii waagu soo kaahay,
Samuu'eel ayaa Saa'uul gurigii dushiisa uga yeedhay, oo
ku yidhi, Kac aan ku diree. Markaasaa Saa'uul kacay, oo
isaga iyo Samuu'eelba dibadday u baxeen. **27** Oo markay
ka sii dhaadhacayeen magaalada darafkeeda, Samuu'eel
ayaa Saa'uul ku yidhi, Midiidinka u sheeg inuu inaga sii
hor maro, (markaasuu isna ka hor maray, ) laakiinse adigu
istaag haatan, aan erayga Ilaah ku maqashiiyee.

**10** Markaasaa Samuu'eel wuxuu qaaday weel saliid ah,
kolkaasuu madaxiisii ku shubay, oo intuu dhunkaday
ayuu yidhi, Sow Rabbigu kuuma subkin inaad amiir u ahaatid
dhaxalkiisa? **2** Maanta markaad iga tagto, waxaad laba nin
ka heli doontaa qabriga Raaxeel agtiisa, kaasoo ku yaal
soohdinta reer Benyaamiinka Selsax ku jira, oo waxay kugu
odhan doonaan, Dameerihii aad soo doontay waa la helay,
oo bal eeg, aabbahaa dameerihii wuu ka dan baxay, oo adiga
aawadaa buu ka fikirayaa, oo wuxuu yidhi, Maxaan wiilkaygii
u sameeyaa? **3** Oo halkaasna waad ka sii socon doontaa
oo waxaad iman doontaa geedka Taaboor, oo halkaasna
waxaad kula kulmi doontaa saddex nin oo u socota xagga
Ilaah iyo ilaa Beytel; mid wuxuu sidaa saddex orgi oo yaryar,
mid kalena wuxuu sidaa saddex xabbadood oo kibis ah,
kan kalena wuxuu sidaa sibraar khamri ah. **4** Way ku
salaami doonaan, oo waxay ku siin doonaan laba xabbadood
oo kibis ah, oo aad gacantooda ka guddoomi doonto. **5**
Oo taas dabadeedna waxaad iman doontaa buurta Ilaah,
meeshaasoo ay joogaan ciidankii Falastiin, oo waxay noqon
doontaa markaad magaalada timaadid inaad la kulmi doonto
guuto nebiyo ah ee ka soo degaysa meesha sare iyagoo
horta ku sita shareerad, iyo daf, iyo biibiile, iyo kataarad, oo
iyana wax bay sii sheegi doonaan. **6** Markaasaa Ruuxa Ilaah
si xoog leh kuugu soo degi doonaa, oo markaasaad iyaga
wax la sii sheegi doontaa, oo waxaad u beddelmi doontaa nin
kale. **7** Haddaba markii calaamooyinkaasu ku soo gaadhaan,
waxaad samaysaa wixii ku soo gaadha oo dhanba, maxaa
yeelay, Ilaah baa kula jira. **8** Oo waxaad ku dhaadhacdaa,
oo iga hor martaa xagga Gilgaal; oo bal eeg, anna waan kuu
iman doonaa, inaan bixiyo qurbaanno la gubo, iyo inaan
bixiyo qurbaanno nabaadiino. Toddoba maalmood waa inaad
i sugtaa, ilaa aan kuu imaado oo aan ku tuso waxaad samayn
doonto. **9** Oo waxaa dhacday markuu dhabarka u jeediyey
Samuu'eel, inuu Ilaah siiyey qalbi kale, oo calaamooyinkaasi
oo dhammuna maalintaasay wada ahaadeen. **10** Oo markay
buurtii yimaadeen waxaa la kulmay guuto nebiyo ah, oo
Ruuxii Ilaahna si xoog leh ayuu ugu soo degay isagii,
markaasuu dhexdoodii wax ka sii sheegay. **11** Oo kuwii mar
hore isaga yiqiin oo dhammu, markay arkeen inuu nebiyada
wax la sii sheegayo, ayaa dadkii midba kan kale ku yidhi,
War waa maxay waxan ku dhacay wiilkii Qiish? Saa'uulna
ma nebiyaduu ka mid yahay? **12** Oo mid halkaas joogay ayaa
isna yidhi, Oo aabbahoodna waa kuma? Sidaas daraaddeed
taasu waxay noqotay maahmaah; Saa'uulna ma nebiyaduu
ka mid yahay? **13** Oo markuu dhammeeyey waxsheegiddii
ayuu yimid meeshii sare. **14** Markaasaa Saa'uul adeerkiis
wuxuu ku yidhi isagii iyo midiidinkiisiiba, War xaggee baad
tagteen? Markaasuu yidhi, Dameerihii baannu doonnay, oo
markaannu ogaannay inaan la helin ayaannu Samuu'eel
u nimid. **15** Markaasaa Saa'uul adeerkiis wuxuu ku yidhi,
Waan ku baryayaaye, ii sheeg wixii Samuu'eel idinku yidhi.
**16** Kolkaasaa Saa'uul wuxuu adeerkiis ku yidhi, Bayaan
buu noogu sheegay in dameerihii la helay. Laakiinse xagga
waxa boqortooyadii ku saabsan Samuu'eel ka hadlay uma

uu sheegin. 17 Oo Samuu'eelna dadkii buu dhammaan
isugu yeedhay xagga Rabbiga ilaa Misfaah; 18 oo wuxuu
reer binu Israa'iil ku yidhi, Rabbiga ah Ilaaha reer binu
Israa'iil sidaasuu leeyahay, Reer binu Israa'iilow, anaa Masar
idinka soo bixiyey oo anaa idinka soo samatabbixiyey
gacantii Masriyiinta, iyo kulli boqortooyooyinkii idin dulmay
gacantoodii oo dhan. 19 Laakiinse idinku maanta waad
diiddeen Ilaahiinnii idinka badbaadshay belaayooyinkiinnii iyo
dhibaatooyinkiinnii oo dhan, oo waxaad isagii ku tidhaahdeen,
Maya, laakiinse boqor noo yeel. Haddaba Rabbiga hortiisa ku
soo ururiya qabiilooyinkiinna, iyo kumanyaalkiinna. 20 Sidaas
aawadeed Samuu'eel wuxuu soo dhoweeyey qabiilooyinkii
reer binu Israa'iil oo dhan, oo waxaa lala baxay qabiilkii
reer Benyaamiin. 21 Oo haddana wuxuu soo dhoweeyey
qabiilkii reer Benyaamiin oo qoys qoys ah, oo waxaa lala
baxay qoyskii reer Matrii, oo waxaa kaloo lala baxay Saa'uul
oo ahaa ina Qiish; laakiinse markay doondooneen waa
la waayay. 22 Sidaas daraaddeed Rabbiga wax kalay sii
weyddiiyeen, Weli ma waxaa jira nin kaloo halkan imanaya?
Oo Rabbiguna wuxuu ugu jawaabay, Bal eega, alaabta
dhexdeeda ayuu ku dhuuntaye. 23 Oo intay ordeen ayay
halkaas ka soo kexeeyeen, oo markuu dadkii soo dhex
joogsaday, wuu ka dheeraa dadkii oo dhan garbihiisa iyo
waxa ka sarreeyaba. 24 Markaasaa Samuu'eel wuxuu dadkii
oo dhan ku yidhi, Ma aragtaan kan Rabbigu doortay inaan
mid la mid ahu dadka ku jirin? Kolkaasaa dadkii oo dhammu
dhawaaqeen oo waxay yidhaahdeen, Boqorku ha noolaado.
25 Kolkaasaa Samuu'eel wuxuu dadkii u sheegay sida
boqortooyada xaalkeedu noqon doono, oo buug buuna ku
qoray, oo Rabbiga hortiisa dhigay. Samuu'eelna markaasuu
dadkii oo dhan iska diray, oo nin waluba gurigiisii buu tegey.
26 Oo Saa'uulna wuxuu tegey gurigiisii oo Gibecaah ku yiil;
oo waxaa raacay isagii rag geesiyo ah, oo qalbigooda Ilaah
taabtay. 27 Laakiinse kuwo waxmatarayaal ah ayaa waxay
yidhaahdeen, Ninkanu sidee buu noo badbaadin doonaa?
Oo isagiina way quudhsadeen, oo hadiyadna uma ay keenin.
Laakiinse isagu wuu iska aamusay.

**11** Markaasaa waxaa soo kacay Naaxaash oo ahaa
reer Cammoon, oo wuxuu soo ag degay Yaabeesh
Gilecaad. Oo dadkii Yaabeesh oo dhammu waxay Naaxaash
ku yidhaahdeen, Axdi nala dhigo oo annana waannu
kuu adeegaynaa. 2 Markaasaa Naaxaash oo ahaa reer
Cammoon wuxuu iyagii ku yidhi, Sabab keliya ayaan axdi
idinkula samaysanayaa, taasuna waa anigoo isha midigta
idinka wada bixiya si aan u ceebeeyo reer binu Israa'iil oo
dhan. 3 Markaasaa duqowdii reer Yaabeesh waxay isagii
ku yidhaahdeen, Bal toddoba maalmood na sug, aannu
xuduudka reer binu Israa'iil oo dhan wargeeyayaal u dirnee,
oo dabadeedna haddii aannu wayno mid na badbaadiya,
waannu kuu imanaynaa. 4 Markaasaa wargeeyayaashii
waxay yimaadeen Gibecaahdii Saa'uul, oo erayadan ayay
dadkii u sheegeen. Kolkaasaa dadkii oo dhammu codkoodii
kor u qaadeen oo wada ooyeen. 5 Oo bal eeg, waxaa
yimid Saa'uul oo dibiyadii duurka ka keenay, oo Saa'uulna
wuxuu yidhi, Maxaa ku dhacay dadka oo ay la ooyayaan?
Markaasay u sheegeen hadalladii nimankii reer Yaabeesh.
6 Oo Saa'uulna markuu maqlay hadalladaas ayaa Ruuxa
Ilaah si xoog leh ugu soo degay, oo xanaaqiisiina aad iyo
aad buu u kululaaday. 7 Markaasuu wuxuu qaatay laba
dibi oo intuu qalay ayuu cad cad u kala jaray, oo intuu
wargeeyayaal gacantood u dhiibay ayuu wada gaadhsiiyey
xuduudka reer binu Israa'iil oo dhan, oo wuxuu yidhi, Ku
alla kii aan Saa'uul iyo Samuu'eel soo raacin, sidaas oo
kalaa dibidiisa loo geli doonaa. Markaasaa waxaa dadkii
ku soo dhacday cabsidii Rabbiga, oo waxay u soo baxeen
sidii nin qudha. 8 Markaasuu iyagii ku tiriyey Beseq, oo
reer binu Israa'iil waxay ahaayeen saddex boqol oo kun, oo
raggii reer Yahuudahna waxay ahaayeen soddon kun. 9
Markaasay waxay ku yidhaahdeen wargeeyayaashii yimid,
Dadkii reer Yaabeesh Gilecaad waxaad ku tidhaahdaan,
Berrito markii qorraxdu kulushahay ayaad samatabbixin heli
doontaan. Markaasaa wargeeyayaashii u yimaadeen oo u
warrameen dadkii reer Yaabeesh Gilecaad, oo iyana way
farxeen. 10 Sidaas daraaddeed dadkii reer Yaabeesh waxay
yidhaahdeen, Berrito ayaannu idiin soo bixi doonnaa, oo
waxaad nagu samayn doontaan kulli wax alla wixii idinla
wanaagsan. 11 Oo maalintii dambe Saa'uul wuxuu dadkii ka
dhigay saddex guuto; oo subaxdii hore ayay xeradii soo
dhex galeen, oo waxay reer Cammoon laynayeen tan iyo
hadhkii, oo waxay ahaatay in intii hadhayna kala firidhay, oo
xataa laba iyagii ka mid ahu isma haysan. 12 Markaasaa
dadkii waxay Samuu'eel ku yidhaahdeen, Waa ayo kii yidhi,
Ma Saa'uul baa na xukumaya? Nimankaas soo bixi aannu
dilnee. 13 Kolkaasaa Saa'uul wuxuu yidhi, Ninnaba maanta la
dili maayo, waayo, maanta Rabbigu wuxuu samatabbixiyey
reer binu Israa'iil. 14 Markaasaa Samuu'eel wuxuu dadkii
ku yidhi, Ina keena aynu Gilgaal tagnee oo aynu halkaas
boqortooyada ku cusboonaysiinnee. 15 Markaasaa dadkii oo
dhammu waxay tageen Gilgaal, oo Gilgaal ayay Saa'uul
ku boqreen Rabbiga hortiisa, oo waxay halkaas Rabbiga
hortiisa ku bixiyeen qurbaanno nabaadiino, oo halkaasaa
Saa'uul iyo dadkii reer binu Israa'iil oo dhammu aad ugu
farxeen.

12 Samuu'eel wuxuu reer binu Israa'iil oo dhan ku yidhi,
Bal eega, anigu waan maqlay codkiinnii iyo wixii aad
igu tidhaahdeen oo dhan, oo waxaan idiin yeelay boqor
idiin taliya. 2 Oo haatan, bal eega, boqorkii wuu idin hor
socdaaye, oo anigu waan gaboobay, waanan cirroobay; oo
bal eega, wiilashaydiina way idinla joogaan, oo aniguna
waxaan idin hor socday tan iyo yaraantaydii. 3 Bal waa
i kan. Rabbiga hortiisa igu markhaati fura, iyo kan uu
subkaday hortiisaba. Bal yaan dibigiisii ka qaatay? Amase
bal yaan dameerkiisii ka qaatay? Amase yaan dulmay?
Amase yaan cadaadiyey? Kumaanse gacantiisa laaluush ka
qaatay si aan isu indhatiro daraaddeed? Hadday saas tahay
waan idiin celin. 4 Oo iyana waxay yidhaahdeen, Nama
aad dulmin, namana aad cadaadin, oo ninnaba gacantiisa
waxba kama aad qaadan. 5 Markaasuu isna wuxuu ku
yidhi iyaga, Maanta Rabbigaa idinku marag ah, iyo kan
uu subkaday, inaydnaan waxba gacantayda ku helin. Oo
iyana waxay yidhaahdeen, Haah, isagu waa ka marag. 6
Markaasaa Samuu'eel wuxuu dadkii ku yidhi, Muuse iyo
Haaruun waxaa doortay Rabbiga, oo isagaa awowayaashiin
ka soo saaray dalkii Masar. 7 Haddaba bal joogsada inaan
Rabbiga hortiisa idinkula hadlo wax ku saabsan falimihii
Rabbiga oo xaqa ahaa oo dhan, oo uu idiin sameeyey idinka
iyo awowayaashiinba. 8 Markii Yacquub Masar yimid, oo
awowayaashiin Rabbiga u qayshadeen, kolkaasaa Rabbigu
soo diray Muuse iyo Haaruun, kuwaasoo awowayaashiin ka
soo bixiyey Masar oo halkan soo dejiyey. 9 Laakiinse way
illoobeen Rabbigii Ilaahooda ahaa, markaasuu wuxuu ka
iibsaday oo gacanta u geliyey Siiseraa, oo ahaa sirkaalkii
ciidanka Xaasoor, oo wuxuu geliyey gacantii reer Falastiin,
iyo gacantii boqorkii reer Moo'aab, wayna la dirireen iyaga. 10
Markaasay Rabbiga u qayshadeen, oo yidhaahdeen, Waannu
dembaabnay, maxaa yeelay, waannu kaa tagnay, Rabbiyow,
oo u adeegnay Bacaliim iyo Cashtarod, laakiinse haatan
naga samatabbixi gacanta cadaawayaashayada, oo waannu
kuu adeegi doonnaa. 11 Dabadeedna Rabbigu wuxuu soo
diray Yerubbacal, iyo Bedaan, iyo Yeftaah, iyo Samuu'eel,
oo idinka samatabbixiyey gacantii cadaawayaashiinnii dhan
walba idinka jiray, oo ammaan baad ku degganaateen. 12
Oo markii aad aragteen boqorkii Naaxaash ahaa oo reer
Cammoon inuu idinku soo duulay, waxaad igu tidhaahdeen,
Maya, laakiinse waa inuu boqor noo taliyaa; markaasna
waxaa boqor idiin ahaa Rabbiga Ilaahiinna ah. 13 Haddaba
bal eega boqorkii aad doorateen oo aad i weyddiisateen,
oo hadda bal eega, Rabbigu wuxuu idiin yeelay boqor idiin
taliya. 14 Waa hagaag, haddii aad Rabbiga ka cabsataan
oo aad u adeegtaan, oo aad codkiisa maqashaan, oo
aydnaan ku caasiyoobin amarka Rabbiga, oo aad idinka iyo
boqorka idiin taliyaaba ahaataan kuwo raacaya Rabbiga
Ilaahiinna ah. 15 Laakiinse haddii aydnaan dhegaysan codka
Rabbiga, illowse aad ku caasiyowdaan amarka Rabbiga, de
markaas gacanta Rabbigu gees bay idinka ahaanaysaa,
siday awowayaashiinba uga ahayd. 16 Haddaba bal joogsada
oo eega waxan weyn oo uu Rabbigu ku samayn doono
hortiinna. 17 Sow maanta ma aha maalintii sarreenka
la gooynayay? Anigu Rabbigaan baryayaa inuu soo diro
onkod iyo roob; oo idinna markaasaad ogaan doontaan oo
arki doontaan inuu weyn yahay sharkiinna aad Rabbiga
hortiisa ku samayseen markaad boqor weyddiisateen. 18
Saas aawadeed Samuu'eel Rabbiguu baryay, oo Rabbiguna
maalintaasuu onkod iyo roob soo diray, oo dadkii oo
dhammuna aad iyo aad bay uga cabsadeen Rabbiga iyo
Samuu'eelba. 19 Markaasaa dadkii oo dhammu waxay
Samuu'eel ku yidhaahdeen, Addoommadaada u bari Rabbiga
Ilaahaaga ah, yaannan dhimanne, waayo, dembiyadayadii
oo dhan waxaan ku darsannay sharkan markaannu boqor
weyddiisannay. 20 Oo Samuu'eelna wuxuu dadkii ku yidhi,
Ha cabsanina; xaqiiqa, waxaad samayseen sharkan oo
dhan, laakiinse gees ha uga leexanina Rabbiga lasocodkiisa,
waxaadse ugu adeegtaan qalbigiinna oo dhan; 21 oo gees
ha uga leexanina, waayo, markaas waxaad raaci lahaydeen
waxyaalo aan micne lahayn ee aan waxba tari karin, waxna
badbaadin karin, waayo, iyagu micne ma leh. 22 Maxaa
yeelay, Rabbigu ka tegi maayo dadkiisa, magiciisa weyn
aawadiis; maxaa yeelay, Rabbiga way ka farxisay inuu dad
idinka dhigto. 23 Oo haddana aniga xaggayga, Ilaah ha
iga fogeeyo inaan Rabbiga ku dembaabo, taasoo ah anoo
joojinaya inaan idiin duceeyo; laakiinse waxaan idin barayaa
jidka wanaagsan oo qumman. 24 Laakiinse idinku Rabbiga
ka cabsada, oo si run ah qalbigiinna oo dhan ugu adeega;
waayo, bal ka fiirsada waxyaalaha waaweyn oo uu idiin
sameeyey. 25 Laakiinse haddaad shar sii samaysaan waa
laydin baabbi'in doonaa idinka iyo boqorkiinnaba.

13 Saa'uul markuu reer binu Israa'iil boqorka u noqday
wuxuu jiray soddon sannadood, oo wuxuu reer binu
Israa'iil xukumayay laba sannadood. 2 Markaasaa Saa'uul
wuxuu reer binu Israa'iil ka dhex doortay saddex kun oo nin;
oo laba kun waxay Saa'uul la joogeen Mikmaash iyo buurtii
Beytel, oo kunna wuxuu Yoonaataan la joogay Gibecaahdii
reer Benyaamiin; oo dadka intiisii kalena nin walba wuxuu
u diray inuu teendhadiisii tago. 3 Oo Yoonaataan wuxuu
ku dhuftay xeradii ciidankii reer Falastiin oo Gebac joogay,
oo reer Falastiinna taas way maqleen. Oo Saa'uulna dalkii

oo dhan buu buun ugu dhuftay oo yidhi, Cibraaniyadu ha maqleen. 4 Oo reer binu Israa'iil oo dhammu waxay maqleen in Saa'uul wax ku dhuftay xeradii ciidanka reer Falastiin, iyo weliba in reer Falastiin ay karheen reer binu Israa'iil. Oo dadkiina dhammaantood waxay Saa'uul ugu soo urureen Gilgaal. 5 Oo reer Falastiinna waxay isu soo urursadeen inay reer binu Israa'iil la diriraan, oo waxayna ahaayeen soddon kun oo gaadhifardood, iyo lix kun oo fardooley ah, iyo dad ah sida cammuudda taal badda xeebteeda. Oo intay soo dhowaadeen ayay degeen Mikmaash, oo bari ka xigta Beytaawen. 6 Oo dadkii reer binu Israa'iilna markay arkeen inay cidhiidhi ku jiraan, (waayo, dadku way dhibaataysnaayeen) markaasaa dadkii waxay ku dhuunteen godad, iyo kayn, iyo dhagaxyo dhexdooda, iyo boholo, iyo hogag. 7 Oo haddaba Cibraaniyadii qaarkood waxay ka gudbeen Webi Urdun oo tageen ilaa dalkii reer Gaad iyo Gilecaad; laakiinse Saa'uul weli wuxuu iska joogay Gilgaal, oo dadkii oo dhammuna isagay daba galeen iyagoo gariiraya. 8 Oo toddoba maalmood buu sugayay, sidii wakhtigii Samuu'eel u qabtay uu ahaa, laakiinse Samuu'eel ma iman Gilgaal, oo dadkiina way ka kala firdheen Saa'uul. 9 Markaasaa Saa'uul wuxuu yidhi, Halkan iigu keena qurbaanka la gubo, iyo qurbaannada nabaadiinadaba. Markaasuu bixiyey qurbaankii la gubayay. 10 Oo markuu dhammeeyey bixintii uu bixinayay allabariga la gubo, waxaa yimid Samuu'eel; markaasaa Saa'uul u baxay inuu ka hor tago oo soo salaamo. 11 Markaasaa Samuu'eel wuxuu ku yidhi, War maxaad samaysay? Oo Saa'uulna wuxuu yidhi, Maxaa yeelay, waxaan arkay in dadkii iga kala firdhay, iyo inaad adiguna ku iman weyday maalmihii aan ku ballannay, iyo in reer Falastiinna dhammaantood isku soo urursadeen Mikmaash agteeda; 12 sidaas daraaddeed waxaan is-idhi, Haatan reer Falastiin waxay igu soo weerari doonaan Gilgaal, anigoo aan Rabbiga raallinimo ka baryin. Taas aawadeed ayaan isugu qasbay oo waan bixiyey allabariga la gubo. 13 Markaasaa Samuu'eel wuxuu Saa'uul ku yidhi, Nacasnimo baad samaysay oo amarkii Rabbiga Ilaahaaga ahu kugu amray ma aad xajin. Haatan Rabbigu boqortooyadaaduu ku adkayn lahaa reer binu Israa'iil weligeedba. 14 Laakiinse imminka boqortooyadaadu sii jiri mayso. Rabbigu wuxuu doontay nin ah siduu qalbigiisu doonayo, oo Rabbiguna isaguu u doortay inuu ahaado amiir dadkiisa u taliya, maxaa yeelay, adigu ma aadan xajin wixii Rabbigu kugu amray. 15 Markaasaa Samuu'eel kacay, wuuna ka baxay Gilgaal, oo xagga Gibecaahda reer Benyaamiin buu tegey. Oo Saa'uulna markaasuu tiriyey dadkii isaga la jiray, oo waxay noqdeen in ku dhow lix boqol oo nin. 16 Kolkaasaa Saa'uul iyo wiilkiisii Yoonaataan, iyo dadkii iyaga la jirayba waxay iska joogeen Gebacdii reer Benyaamiin, laakiinse reer Falastiin waxay degganaayeen Mikmaash. 17 Markaasaa xeradii reer Falastiin waxaa ka soo baxay kuwo wax dhaca oo saddex guuto ah, oo guuto waxay u leexatay xagga waddada Cofraah iyo xagga dalka reer Shuucaal; 18 oo guuto kalena waxay u leexatay xagga waddada Beytxooroon, oo guutadii hadhayna waxay u leexatay xagga waddada soohdinta kor ka soo dhawrta dooxada Seboyim iyo xagga cidlada. 19 Haddaba tumaal laguma arag dalka reer binu Israa'iil oo dhan; waayo, reer Falastiin waxay isyidhaahdeen, Cibraaniyadu yaanay samaysan seefo iyo warmo. 20 Laakiinse reer binu Israa'iil oo dhammu waxay xagga reer Falastiin u tageen in nin waluba soo afaysto marashidiisii, iyo manjadiisii, iyo faaskiisii, iyo sabaraddiisii; 21 oo weliba waxay lahaayeen wax lagu soofeeyo sabaradaha, iyo manjooyinka, iyo faraleyada, iyo faasaska, iyo inay hagaajiyaan takiyadaba. 22 Sidaas daraaddeed maalintii dagaalka dadkii la jiray Saa'uul iyo wiilkiisii Yoonaataanba midkoodna gacantiisa lagama helin seef iyo waran toona, Saa'uul iyo wiilkiisii Yoonaataan mooyaane. 23 Oo ciidankii reer Falastiinna waxay u soo baxeen marinkii Mikmaash.

**14** Haddaba waxaa maalin dhacay inuu Yoonaataan ina Saa'uul ku yidhi ninkii dhallinyarada ahaa oo hubkiisa u siday, Bal ina keen aan ciidanka reer Falastiin oo xaggaas jooga u gudubnee. Laakiinse taas uma uu sheegin aabbihiis. 2 Oo Saa'uulna wuxuu joogay Gibecaah darafkeeda, oo wuxuu hoos fadhiyey geed rummaanka ah oo Migroon ku yaal; oo dadkii isaga la joogayna waxay ahaayeen in ku dhow lix boqol oo nin, 3 iyo Axiiyaah oo ahaa ina Axiituub, oo Iikaboodna walaalkiis ahaa, ee ahaa reer Fiinexaas ina Ceelii oo ahaa wadaadkii Rabbiga oo Shiiloh joogay, isagoo eefod qaba. Oo dadkuna ma ogayn inuu Yoonaataan tegey. 4 Oo Yoonaataan marinkii uu doonayay inuu uga gudbo ciidanka reer Falastiin waxaa dhinac kaga yiil buur dhagax ah, dinaca kalena waxaa kaga yiil buur dhagax ah, oo middood magaceedu wuxuu ahaa Boosees, oo tan kale magaceedana waxaa la odhan jiray Seneh. 5 Oo buur waxay ku tiil xagga woqooyi oo Mikmaash ka horraysa, oo tan kalena waxay ku tiil xagga koonfureed oo Gebacda horraysa. 6 Markaasaa Yoonaataan wuxuu ku yidhi ninkii dhallinyarada ahaa oo hubkiisa u siday, Kaalay, oo ina keen aan xagga ciidanka buuryoqabka ah u gudubnee, waayo, waxaa suurtowda in Rabbigu inoo shaqeeyo, maxaa yeelay, Rabbiga waxba kama hor joogsan karaan inuu ku badbaadiyo kuwo badan ama kuwo yarba. 7 Oo kii hubka u sidayna wuxuu ku yidhi,

Wax alla waxa qalbigaaga ku jira yeel, oo bal eeg, waan
kula socdaa, oo sida qalbigaagu yahay weeye kayguna.
8 Markaasaa Yoonaataan wuxuu yidhi, Bal eeg, nimanka
xaggooda ayaynu u gudbaynaa, oo isu muujinaynaa iyaga.
9 Oo haddii ay inagu yidhaahdaan, Jooga halkiinna ilaa
aannu idiin nimaadno, markaas waxaynu iska joogaynaa
meesheenna, oo una tegi mayno. 10 Laakiinse haddii ay
inagu yidhaahdaan, Kaalaya oo soo fuula, markaasaynu
fuulaynaa, waayo, Rabbigu iyaga gacanteennuu soo geliyey,
oo taasaa calaamadii inoo ahaan doonta. 11 Oo labadoodiiba
waxay isu muujiyeen ciidankii reer Falastiin; markaasay kuwii
reer Falastiin waxay yidhaahdeen, Bal eega Cibraaniyadii
waxay ka soo baxayaan godadkii ay ku dhuunteene. 12 Oo
raggii ciidanku waxay Yoonaataan iyo kii hubkiisa u siday
ugu jawaabeen oo ku yidhaahdeen, Soo fuula, wax baannu
idin tusaynaaye. Markaasaa Yoonaataan wuxuu ku yidhi
kii hubkiisa u siday, Iga soo daba fuul, waayo, Rabbigu
wuxuu iyaga soo geliyey gacanta reer binu Israa'iil. 13
Markaasaa Yoonaataan buurtii fantay, kii hubkiisa u sidayna
wuu daba socday, oo kuwii reer Falastiinna way ku hor
dhaceen Yoonaataan, kii hubkiisa u sidayna wuu ka daba
laayay. 14 Yoonaataan iyo kii hubkiisa u siday intii ugu
horraysay oo ay laayeen waxay ahayd in ku dhow labaatan
nin oo ay ku laayeen goob nus tacab ah. 15 Oo cabsi
weyn bay la qadhqadheen kuwii xerada ku jiray, iyo kuwii
duurka joogay iyo dadkii oo dhanba; oo xataa ciidankii, iyo
waxdhacayaashuna way wada gariireen, oo dhulkuna waa
gariiray, haddana waxaa jiray gariir aad iyo aad u weyn.
16 Markaasaa Saa'uul waardiyayaashiisii Gibecaahdii reer
Benyaamiin joogay wax fiiriyeen, oo waxay arkeen dadkii
badnaa oo kala firdhay oo xaggan iyo xaggaa u kala yaacay.
17 Kolkaasaa Saa'uul wuxuu dadkii isaga la jiray ku yidhi,
Bal tiriya, oo eega kii inaga tegey kuu yahay. Oo markay
tiriyeen waxay arkeen inayan Yoonaataan iyo kii hubkiisa u
siday halkaas joogin. 18 Markaasaa Saa'uul wuxuu Axiiyaah
ku yidhi, Sanduuqii Ilaah halkan keen. Waayo, waagaas
sanduuqa Ilaah wuxuu la jiray reer binu Israa'iil. 19 Oo
markuu Saa'uul la hadlayay wadaadkii, rabshaddii ku jirtay
xerada reer Falastiin ayaa sii adkaatay oo sii badatay;
kolkaasaa Saa'uul wuxuu wadaadkii ku yidhi, Gacanta laab.
20 Markaasaa Saa'uul iyo dadkii la jiray oo dhammuba isa soo
wada urursadeen, oo waxay yimaadeen goobtii dagaalka.
Oo bal eeg, nin walba seeftiisii waxay ku dhacday saaxiibkiis,
oo waxaa jiray baabba' aad u weyn. 21 Oo Cibraaniyadii
markii hore la jiray reer Falastiin, oo intay raaceen xerada la
galay, iyagoo dalka ku wareegsan ka yimid, xataa iyana way
soo jeesteen, oo waxay ku darmadeen reer binu Israa'iilkii
la jiray Saa'uul iyo Yoonaataan. 22 Oo sidaas oo kalena
kulli raggii reer binu Israa'iil oo mar hore ku dhuuntay dalka
buuraha leh oo reer Efrayim, iyana markii ay maqleen in reer
Falastiin carareen ayay soo raacdaysteen oo dagaalkii soo
galeen. 23 Sidaasuu Rabbigu maalintaas u badbaadiyey
reer binu Israa'iil; oo dagaalkiina wuxuu u sii gudbay xagga
Beytaawen. 24 Oo maalintaas dadka reer binu Israa'iil way
dhibaataysnaayeen; laakiinse Saa'uul baa dadkii dhaariyey
oo ku yidhi, Ilaa ay fiidkii noqoto, oo aan cadaawayaashayda
ka aarsado ninkii wax cuna inkaaru ha ku dhacdo. Haddaba
dadkii cunto ma dhadhamin innaba. 25 Oo dadkii oo dhammu
waxay soo galeen duurkii, dhulkana waxaa yiil malab. 26 Oo
markii dadkii soo galay duurkii ayaa malabkii soo dareeray,
laakiinse ninna gacanta afka ma saarin, waayo, dadku
waxay ka cabsadeen dhaartii. 27 Laakiinse Yoonaataan
ma uu maqlin markii aabbihiis dadka dhaarta ku amray,
sidaas aawadeed wuxuu soo fidiyey ushii gacanta ugu
jirtay caaraddeedii, oo wuxuu daray malabkii, markaasuu
gacantii afka saaray; oo indhihiisiina aad bay u iftiimeen.
28 Markaasaa dadkii mid ka mid ahu u jawaabay, oo ku
yidhi, Aabbahaa dadka dhaar buu aad ugu amray oo yidhi,
Maanta ninkii wax cuna inkaaru ha ku dhacdo. Oo dadkiina
way itaal darnaayeen. 29 Markaasaa Yoonaataan wuxuu
yidhi, Aabbahay isagaa dalka dhibay, waan idin baryayaaye,
bal eega sida indhahaygu u iftiimeen, maxaa yeelay, in
yar baan ka dhadhamiyey malabkan. 30 Haddaba intee
bay ka sii fiicnaan lahayd haddii dadku maanta ikhtiyaar
wax uga cuni lahaayeen wixii ay cadaawayaashooda ka
dhaceen ee ay heleen? Waayo, hadday sidaas ahaan lahayd
reer Falastiin dhexdooda layn tan ka weyn baa ku dhici
lahayd. 31 Oo maalintaas waxay reer Falastiin ku laayeen
ilaa Mikmaash iyo tan iyo Ayaaloon; oo dadkuna aad bay u
itaal darnaayeen. 32 Oo dadkiina wixii ay dhaceen ayay
ku boodeen, oo waxay qaateen ido iyo dibi iyo weylo, oo
dhulkay ku qasheen, markaasaa dadkii waxay cuneen hilibkii
oo dhiig leh. 33 Dabadeedna waxaa loo sheegay Saa'uul,
oo lagu yidhi, Bal eeg, dadku Rabbigay ku dembaabaan,
markay cunaan hilib dhiig leh. Markaasuu wuxuu ku yidhi,
Aad baad u xadgudubteen, haddaba maanta ii soo giringiriya
dhagax weyn. 34 Markaasaa Saa'uul wuxuu yidhi, Dadka
dhex gala, oo waxaad ku tidhaahdaan, Nin waluba halkan
ha iigu keeno dibigiisa, nin walubana laxdiisa, oo halkan ku
gowraca oo cuna; oo Rabbiga ha ku dembaabina intaad
hilib dhiig leh cuntaan. Habeenkaas dadkii oo dhammu
nin waluba wuxuu keenay dibigiisii, kolkaasay halkaas ku
gowraceen. 35 Markaasaa Saa'uul wuxuu Rabbiga u dhisay
meel allabari, oo taasuna waxay ahayd meeshii allabariga ee

ugu horraysay uu Rabbiga u dhiso. 36 Saa'uulna wuxuu yidhi,
Ina keena aynu reer Falastiin raacdaysannee oo habeennimo
mirnee, oo tan iyo aroortii dhacnee, oo ninkoodna yeynan ka
sii dayn. Oo iyana waxay ku yidhaahdeen, Wax alla wixii kula
wanaagsan samee. Markaasaa wadaadkii wuxuu yidhi, Ina
keena aynu Rabbiga u dhowaannee. 37 Markaasaa Saa'uul
Ilaah talo weyddiistay, oo wuxuu yidhi, Miyaan reer Falastiin
raacdaystaa? Oo ma doonaysaa inaad iyaga soo geliso
gacanta reer binu Israa'iil? Laakiinse maalintaas Ilaah uma
uu jawaabin. 38 Kolkaasaa Saa'uul wuxuu yidhi, Madaxda
reer binu Israa'iil oo dhammay, soo dhowaada, oo maanta
dembiganu wuxuu ku jiray bal soo ogaada oo soo eega. 39
Waayo, Rabbiga reer binu Israa'iil badbaadiya noloshiisaan
ku dhaartaye, xataa hadduu ku jiray wiilkayga Yoonaataan,
hubaal kaasu wuu dhiman doonaa. Laakiinse dadkii oo dhan
laguma arag nin u jawaabay. 40 Markaasuu reer binu Israa'iil
oo dhan ku yidhi, Idinku dhan joogsada, aniga iyo wiilkayga
Yoonaataanna dhanka kale ayaannu joogsanaynaa. Dadkiina
waxay Saa'uul ku yidhaahdeen, Wixii kula wanaagsan
samee. 41 Sidaas daraaddeed Saa'uul wuxuu ku yidhi
Rabbiga ah Ilaaha reer binu Israa'iil, Saamiga runta ah na
tus. Oo wuxuu saamigii ku dhacay Yoonaataan iyo Saa'uul,
laakiinse dadkii way baxeen. 42 Markaasaa Saa'uul wuxuu
yidhi, Noo saami rida aniga iyo wiilkayga Yoonaataan.
Dabadeedna saamigii wuxuu ku dhacay Yoonaataan. 43
Kolkaasaa Saa'uul wuxuu Yoonaataan ku yidhi, Bal ii sheeg
waxaad samaysay. Oo Yoonaataan wuu u sheegay oo ku
yidhi, Xaqiiqa in yar oo malab ah ayaan ku dhadhamiyey
ushii gacanta iigu jirtay caaraddeedii; haddaba waa inaan
dhintaa. 44 Markaasaa Saa'uul wuxuu ku yidhi, Ilaah saas
iyo si ka sii daran ha sameeyo, waayo, Yoonaataan, hubaal
waa inaad dhimataa. 45 Oo dadkii waxay Saa'uul ku
yidhaahdeen, Yoonaataan oo badbaadadan weyn ku dhex
sameeyey reer binu Israa'iil, ma inuu dhintaa? Yaanay
noqon; Rabbiga noloshiisaan ku dhaarannay ee waa inaan
tin keliya oo madaxiisu dhulka ku dhicin; waayo, isagu
wuxuu maanta la shaqeeyey Ilaah. Sidaasay dadkii u
samatabbixiyeen Yoonaataan inuusan dhiman. 46 Markaasaa
Saa'uul wuxuu ka hadhay reer Falastiin raacdaysigoodii;
oo reer Falastiinna meeshoodii bay tageen. 47 Oo markii
Saa'uul qabsaday boqortooyada reer binu Israa'iil wuxuu la
diriray kulli cadaawayaashiisii dhan kasta ka jiray, kuwaasoo
ahaa reer Moo'aab, iyo reer Cammoon, iyo reer Edom, iyo
boqorradii reer Soobaah, iyo reer Falastiin; oo meel kasta
oo uu u jeestayba si xun buu ugu galay. 48 Oo isagu si
xoog leh ayuu wax ku sameeyey, oo wuxuu laayay reer
Siiqlag oo reer binu Israa'iilna wuxuu ka samatabbixiyey
gacantii kuwii dhici jiray. 49 Haddaba Saa'uul wiilashiisii
waxay ahaayeen Yoonaataan iyo Yishwii, iyo Melkiishuuca;
oo labadiisii gabdhoodna magacyadoodii waxay ahaayeen
Meerab iyo Miikaal; tii curadda ahayd magaceedu wuxuu
ahaa Meerab, tii yaraydna magaceeda waxaa la odhan jiray
Miikaal. 50 Oo naagtii Saa'uul magaceeduna wuxuu ahaa
Axiino'am, oo waxay ahayd ina Axiimacas; oo sirkaalkii
ciidankiisana magiciisu wuxuu ahaa Abneer, wuxuuna ahaa
ina Neer, kaasoo ahaa Saa'uul adeerkiis. 51 Oo Qiishna
wuxuu ahaa Saa'uul aabbihiis; oo Neer oo ahaa Abneer
aabbihiis isna wuxuu ahaa ina Abii'eel. 52 Oo intii Saa'uul
noolaa oo dhan dagaal kulul oo reer Falastiin ka gees ah
ayaa jiray. Oo Saa'uulna markuu arko nin xoog leh, amase
nin daran wuu qaadan jiray.

15 Markaasaa Samuu'eel wuxuu Saa'uul ku yidhi, Rabbigu
wuxuu ii soo diray inaan kuu subko inaad boqor u
ahaatid dadkiisa reer binu Israa'iil; haddaba bal maqal codka
erayada Rabbiga. 2 Rabbiga ciidammadu wuxuu leeyahay,
Reer binu Israa'iil markay Masar ka soo baxeen, Camaaleq
wuxuu ku sameeyey iyo siduu jidka ugu hor joogsaday waan
ogaaday. 3 Haddaba tag oo reer Camaaleq laa, oo waxay
haystaan oo dhan wada baabbi'i, oo iyaga innaba ha u
tudhin, laakiinse wada laa nin iyo naag, iyo dhallaan iyo
caanonuugba, iyo dibi iyo ido, iyo geel iyo dameerroba. 4
Markaasaa Saa'uul dadkii u yeedhay, oo Tela'iim buu ku
tiriyey, oo waxay noqdeen laba boqol oo kun oo nin oo lug
ah, iyo toban kun oo nin ee reer Yahuudah ah. 5 Kolkaasuu
Saa'uul yimid magaaladii reer Camaaleq, oo dooxadii buu
ugu soo dhuuntay. 6 Markaasaa Saa'uul wuxuu reer Qeyn
ku yidhi, Taga oo ka dhex baxa reer Camaaleq, yaanan
idinku dhex baabbi'ine; waayo, markii ay reer binu Israa'iil oo
dhammu Masar ka soo baxeen waad u wada roonaateen.
Sidaas aawadeed reer Qeyn way ka dhex baxeen reer
Camaaleq. 7 Oo Saa'uul wuxuu reer Camaaleq ku laayay
xagga Xawiilaah ilaa xagga Shuur, taasoo ku taal Masar
horteeda. 8 Oo boqorkii reer Camaaleq oo Agag ahaa isagoo
nool buu qabsaday, laakiinse dadkii kale oo dhan seef buu
ku wada baabbi'iyey. 9 Laakiinse Saa'uul iyo dadkiiba way
reebeen Agag, iyo intii ugu wanaagsanayd oo dhan oo idihii,
iyo dibidii, iyo xoolihii shishislaa, iyo wanankii yaryaraa,
iyo wixii wanaagsanaa oo dhan; oo ma ay doonayn inay
wada baabbi'iyaan; laakiinse waxay wada baabbi'iyeen wixii
la quudhsaday iyo intii liidatay oo dhan. 10 Markaasaa
Samuu'eel waxaa u yimid Eraygii Rabbiga oo ku leh, 11
Waxaan ka qoomamoonayaa inaan Saa'uul boqor ka dhigay;
waayo, lasocodkaygii dib buu uga noqday, oo mana uu
oofin amarradaydii. Oo Samuu'eelna wuu cadhooday oo

habeenkii oo dhan Rabbiguu u qaylinayay. 12 Markaasaa
Samuu'eel aroor hore kacay, oo wuxuu damcay inuu Saa'uul
ka hor tago; oo waxaa Samuu'eel loo sheegay oo lagu
yidhi, Saa'uul baa yimid Karmel, oo bal eeg, halkaas tiir
xusuus ah ayuu ka taagtay, oo intuu wareegay ayuu gudbay,
oo Gilgaal ku dhaadhacay. 13 Oo Samuu'eelna Saa'uul
buu u yimid; markaasaa Saa'uul ku yidhi isagii, Rabbigu
ha ku barakeeyo; anigu amarkii Rabbiga waan oofiyey. 14
Markaasaa Samuu'eel wuxuu yidhi, Haddaba waa maxay
micneheedu cidan idaha ee aan dhegahayga ku maqlayaa,
iyo cida dibida ee aan maqlayaa? 15 Oo Saa'uulna wuxuu
yidhi, Reer Camaaleq bay ka keeneen; waayo, dadku
waxay u reebeen intii ugu wanaagsanayd ee idihii iyo
dibidii inay allabari ugu bixiyaan Rabbiga Ilaahaaga ah; intii
kalese dhammaantood waannu baabbi'innay. 16 Markaasaa
Samuu'eel wuxuu Saa'uul ku yidhi, Bal sug, oo anna waxaan
kuu sheegayaa wixii Rabbigu xalay igu yidhi. Markaasuu
yidhi, Bal ii sheeg. 17 Markaasaa Samuu'eel wuxuu yidhi,
In kastoo aad isla yarayd, sow madax lagaagama dhigin
qabiilooyinka reer binu Israa'iil? Oo Rabbigu waa kuu subkay
inaad ahaato boqor u taliya reer binu Israa'iil; 18 oo Rabbigu
sodcaal buu kuu diray, oo kugu yidhi, Tag oo wada baabbi'i
dembilayaasha reer Camaaleq, oo la dirir ilaa ay baabba'aan.
19 Haddaba maxaad Rabbiga codkiisa u addeeci weyday, oo
aadse ugu boodday wixii la dhacay, oo maxaad u samaysay
wixii Rabbiga hortiisa sharka ku ahaa? 20 Markaasaa
Saa'uul wuxuu Samuu'eel ku yidhi, Waan addeecay Rabbiga
codkiisii, oo waxaan maray jidkii Rabbigu igu diray, oo
Agag oo ah boqorkii reer Camaaleq ayaan keenay, oo
reer Camaaleqna dhammaan waan wada baabbi'iyey. 21
Laakiinse dadkii wax bay ka qaateen xoolihii la dhacay ee
ahaa ido iyo dibi, iyo waxyaalihii khaaska ahaa ee la nidray
inay Gilgaal allabari ugu bixiyaan Rabbiga Ilaahaaga ah.
22 Markaasaa Samuu'eel yidhi, Rabbigu miyuu aad ugu
farxaa qurbaanno la gubo iyo allabaryo, siduu ugu farxo in
codka Rabbiga la addeeco? Bal eeg, addeeciddu waa ka
wanaagsan tahay allabariga, maqlidduna waa ka wanaagsan
tahay baruurta wananka. 23 Waayo, caasinimadu waxay la
mid tahay dembiga sixirka, madaxadaygguna wuxuu la mid
yahay shar iyo sanam caabudidda. Waxaad diidday Eraygii
Rabbiga, oo sidaas daraaddeed isna wuxuu kuu diiday inaad
boqor sii ahaatid. 24 Markaasaa Saa'uul wuxuu Samuu'eel
ku yidhi, Waan dembaabay, waayo, amarkii Rabbiga, iyo
erayadaadiiba waan ku xadgudbay, maxaa yeelay, dadkii
baan ka cabsaday, codkoodiina waan addeecay. 25 Haddaba
waan ku baryayaaye dembigayga iga cafi, oo mar kale ila
noqo, aan Rabbiga soo caabudee. 26 Oo Samuu'eelna
wuxuu Saa'uul ku yidhi, Kula noqon maayo, waayo, Eraygii
Rabbigaad diidday, oo Rabbigaana kuu diiday inaad sii
ahaatid boqor reer binu Israa'iil u taliya. 27 Oo markii
Samuu'eel ka jeestay oo uu damcay inuu tago, ayuu qabsaday
darafkii khamiiskiisa, wuuna dillaacay. 28 Markaasaa
Samuu'eel isagii ku yidhi, Maanta Rabbigu boqortooyadii
reer binu Israa'iil buu kaa dillaaciyey, wuxuuna siiyey mid
deriskaaga ah oo kaa sii wanaagsan. 29 Kan xoogga reer binu
Israa'iil ahna been sheegi maayo, qoomamaynna maayo;
waayo, isagu ma aha nin qoomamooda. 30 Markaasuu
yidhi, Waan dembaabay; haddaba waan ku baryayaaye, igu
murwee duqowda dadkayga hortooda, iyo reer binu Israa'iil
hortooda, oo mar kale ila noqo aan Rabbiga Ilaahaaga ah
soo caabudee. 31 Haddaba Samuu'eel mar kaluu Saa'uul la
noqday, oo Saa'uulna Rabbiguu soo caabuday. 32 Markaasaa
Samuu'eel wuxuu yidhi, Halkan iigu keena boqorka reer
Camaaleq ee Agag ah. Kolkaasaa Agag u yimid isagoo
qalbi san. Oo wuxuu yidhi, Hubaal geerida qadhaadhkeedii
waa i dhaafay. 33 Oo Samuu'eelna wuxuu ku yidhi, Sida
seeftaadu dumarka u ilmo tirtay, saasoo kalay hooyadaana
dumarka dhexdiisa ugu ilmola'aan doontaa. Oo Samuu'eelna
Agag ayuu cad cad ugu jarjaray Gilgaal dhexdeeda Rabbiga
hortiisa. 34 Markaasaa Samuu'eel Raamaah tegey; oo
Saa'uulna wuxuu tegey xaggii gurigiisii oo ku yiil Gibecaahdii
Saa'uul. 35 Samuu'eelna mar dambe uma iman inuu Saa'uul
soo arko ilaa maalintii uu dhintay; laakiin Samuu'eel baa
Saa'uul u ooyay; oo Rabbiguna wuxuu ka qoomamooday
inuu Saa'uul ka dhigay boqor u taliya reer binu Israa'iil.

16 Markaasaa Rabbigu wuxuu Samuu'eel ku yidhi, War
ilaa goormaad Saa'uul u ooyaysaa, adigoo og inaan
u diiday inuu reer binu Israa'iil boqor u ahaado? Haddaba
geeskaaga saliid ka buuxso oo tag, waxaan kuu dirayaa
Yesay oo ah reer Beytlaxam; waayo, boqor baan wiilashiisa
ka dhex doortay. 2 Oo Samuu'eelna wuxuu yidhi, Sidee
baan u tegi karaa? Waayo, haddii Saa'uul taas maqlo
wuu i dili doonaa. Oo Rabbiguna wuxuu ku yidhi, Waxaad
kaxaysataa qaalin lo' ah, oo waxaad tidhaahdaa, Waxaan u
imid inaan Rabbiga allabari u bixiyo. 3 Oo Yesay allabariga
ugu yeedh, waanan ku tusi doonaa waxaad samayn doonto;
oo waxaad ii subagtaa kii aan kuu magacaabo. 4 Oo
Samuu'eelna wuxuu Rabbigu kala hadlay ayuu sameeyey,
wuxuuna yimid Beytlaxam. Oo odayaashii magaaladuna way
ka hor tageen, iyagoo gariiraya, oo waxay ku yidhaahdeen,
Nabad ma u timid? 5 Markaasuu yidhi, Haah, nabad baan
u imid, waxaanan u imid inaan Rabbiga allabari u bixiyo.
Haddaba isa soo daahiriya, oo kaalaya, meesha allabariga ii
raaca. Markaasuu wuxuu daahirshay Yesay iyo wiilashiisii,

dabadeedna meeshii allabariga buu ugu yeedhay. 6 Oo
markay yimaadeen wuxuu fiiriyey Elii'aab, oo yidhi, Hubaal
kii Rabbigu subkaday ayaa hortiisa jooga. 7 Markaasaa
Rabbigu wuxuu Samuu'eel ku yidhi, Ha fiirin soojeedkiisa,
ama dhererkiisa, maxaa yeelay, waan diiday isaga. Rabbigu
wax uma arko sida dadku wax u arko, waayo, dadku wuxuu
fiiriyaa muuqashada dusha, Rabbiguse qalbiguu fiiriyaa. 8
Markaasaa Yesay u yeedhay Abiinaadaab, oo soo mariyey
Samuu'eel hortiisa, Samuu'eelna wuxuu yidhi, Rabbigu
kanna ma uu dooran. 9 Oo haddana Yesay wuu soo hor
mariyey Shammaah. Oo wuxuu yidhi, Rabbigu kanna ma
dooran. 10 Yesayna wuxuu Samuu'eel soo hor mariyey
toddoba wiilashiisii ka mid ah. Markaasaa Samuu'eel wuxuu
Yesay ku yidhi, Rabbigu kuwan ma dooran. 11 Samuu'eelna
wuxuu Yesay ku yidhi, War carruurtaadii halkan ma wada
joogaan? Markaasuu yidhi, Weli waxaa hadhay kii ugu yaraa,
oo idahuu ilaalinayaa. Oo haddana Samuu'eel wuxuu Yesay
ku yidhi, Cid u dir oo keen; waayo, innagu fadhiisan mayno
jeeruu halkan yimaado. 12 Markaasuu u cid diray, oo soo
geliyey. Oo isna wuxuu ahaa mid cas, oo soojeed qurxoon,
oo midabkiisuna aad u wanaagsan yahay. Markaasaa
Rabbigu wuxuu Samuu'eel ku yidhi, Kac, oo subag, waayo,
kanu waa isagii. 13 Markaasaa Samuu'eel qaaday geeskii
saliiddu ku jirtay, wuuna ku subkay isagoo walaalihiis dhex
jooga; oo maalintaas intii ka dambaysay Ruuxii Rabbigu
aad buu ugu soo degay Daa'uud. Dabadeedna Samuu'eel
wuu kacay, oo Raamaah buu tegey. 14 Haddaba Ruuxii
Rabbigu Saa'uul wuu ka tegey, oo ruux shar leh oo xagga
Rabbiga ka yimid ayaa dhibay isagii. 15 Markaasaa Saa'uul
addoommadiisii waxay ku yidhaahdeen, Bal eeg, haatan
waxaa ku dhibaya ruux shar leh oo xagga Ilaah ka yimid. 16
Sayidkayagow, nagu amar annagoo ah addoommadaada
ku hor jooga inaannu kuu doondoonno nin aad kataaradda
u yaqaan; oo markuu ruuxa sharka leh ee xagga Ilaah ka
yimid kugu soo dego, ayuu kataaradda garaaci doonaa,
waanad bogsan doontaa. 17 Markaasaa Saa'uul wuxuu
addoommadiisii ku yidhi, Ii doona nin aad u yaqaan, oo ii
keena. 18 Dabadeedna raggii dhallinyarada ahaa midkood
ayaa ku jawaabay oo yidhi, Waxaan arkay Yesayga reer
Beytlaxam wiil uu dhalay oo aad u yaqaan sida kataaradda
lagu dhufto oo ah nin xoog leh oo dagaalyahan ah, codkarna
ah, oo suurad qurxoon, oo weliba Rabbiguna wuu la jiraa.
19 Sidaas daraaddeed Saa'uul wargeeyayaal buu u diray
Yesay oo ku yidhi, Wiilkaaga Daa'uud oo idaha ilaalinaya ii
soo dir. 20 Markaasaa Yesay wuxuu soo kexeeyey dameer
ku raran kibis iyo sibraar khamri ah, iyo orgi yar, oo Saa'uul
buu u diray. Wuxuuna ugu sii dhiibay wiilkiisii Daa'uud.
21 Markaasaa Daa'uud Saa'uul u yimid, oo hortiisuu soo
istaagay, oo isna aad buu u jeclaaday Daa'uud, oo wuxuu
Saa'uul u noqday kii hubka u siday. 22 Kolkaasaa Saa'uul
farriin u diray Yesay oo ku yidhi, Waan ku baryayaaye,
ii daa Daa'uud, hortayda ha joogee, waayo, isagu aad
buu iiga farxiyey. 23 Oo markuu ruuxii sharka lahaa ee
xagga Ilaah ka yimid Saa'uul ku soo degay ayaa Daa'uud
qaatay kataaraddiisii, oo garaacay, dabadeedna Saa'uul wuu
qaboobay, wuuna bogsaday, oo ruuxii sharka lahaana waa
ka tegey.

**17** Haddaba reer Falastiin waxay soo wada ururiyeen
ciidammadoodii oo dagaal isu diyaariyey, oo waxay
dhammaantood ku soo wada urureen Sokoh, oo ay reer
Yahuudah leeyihiin, oo waxay soo degeen Efes Dammiim oo
u dhexaysa Sokoh iyo Caseeqaah. 2 Markaasay Saa'uul
iyo raggii reer binu Israa'iilna isa soo wada urursadeen,
oo waxay soo degeen dooxada Eelaah, oo isu diyaariyeen
inay la dagaallamaan reer Falastiin. 3 Oo reer Falastiin
waxay soo istaageen buur dhinac ah, reer binu Israa'iilna
waxay soo istaageen buur dhinacii kale ah; oo waxaana
labada qolo u dhexaysay dooxo. 4 Oo waxaa xeradii reer
Falastiin ka soo baxay nin tiirri ah oo magiciisa la yidhaahdo
Goli'ad, oo reer Gad ah oo dhererkiisuna wuxuu ahaa lix
dhudhun iyo taako. 5 Oo waxaa madaxiisa u saarnaa
koofiyad naxaas ah, dhar bir ahna wuu huwanaa, oo dharka
miisaankiisuna wuxuu ahaa shan kun oo sheqel oo naxaas
ah. 6 Oo lugahana waxaa ugu xidhnaa naxaas, garbaha
dhexdoodana naxaas kale. 7 Oo samayda warankiisuna
waxay le'ekayd dharsameeyaha looxiisa, oo miisaanka afka
warankiisuna wuxuu ahaa lix boqol oo sheqel oo bir ah;
oo waxaana hor socday gaashaansidihiisii. 8 Oo intuu soo
istaagay ayuu ku qayliyey ciidammadii reer binu Israa'iil, oo
ku yidhi, War maxaad ugu soo baxdeen oo aad dagaal isugu
soo diyaariseen? Sow anigu ma ihi reer Falastiin, idinna
ma ihidin addoommadii Saa'uul? Haddaba nin iska soo
doorta, oo isna ha ii soo dhaadhaco. 9 Oo hadduu awoodo
inuu ila diriro oo i dilo, markaas waxaan idiin noqonaynaa
addoommadiinnii; laakiinse haddaan ka adkaado oo dilo
isaga, markaas waxaad noo noqonaysaan addoommo oo
waad noo adeegaysaan. 10 Oo kii reer Falastiin wuxuu yidhi,
Ciidammada reer binu Israa'iilow, car, maanta ii soo dira nin
ila dirira. 11 Oo Saa'uul iyo reer binu Israa'iil oo dhammu
markay maqleen erayadii reer Falastiin way nexeen, aad
bayna u cabsadeen. 12 Haddaba Daa'uud wuxuu ahaa
wiil uu dhalay nin reer Efraad ah oo deggan Beytlaxamta
reer Yahuudah, oo magiciisana la yidhaahdo Yesay; oo

isna wuxuu lahaa siddeed wiil; oo ninkaasuna wuxuu ahaa
nin duq ah oo joogay wakhtigii Saa'uul, oo dadkana aad
buu ugu dhex gaboobay. 13 Oo Yesay saddexdiisii wiil oo
waaweynayd waxay Saa'uul u raaceen xagga dagaalka; oo
saddexdiisii wiil oo dagaalka tagtay magacyadoodii waxay
ahaayeen Elii'aab kii curadka ahaa, iyo Abiinaadaab oo
ku xigay, iyo kan saddexaad oo Shammaah ahaa. 14
Oo Daa'uudna wuxuu ahaa kii ugu yaraa; saddexdii ugu
waaweynaydna waxay raaceen Saa'uul. 15 Daa'uudna hadba
Saa'uul wuu ka tegi jiray, wuuna ku soo noqon jiray, inuu
idaha aabbihiis Beytlaxam ku daajiyo aawadeed. 16 Oo kii
reer Falastiinna wuu soo dhowaan jiray subax iyo fiidba,
oo wuxuu ismuujiyey afartan maalmood. 17 Markaasaa
Yesay wuxuu wiilkiisii Daa'uud ku yidhi, Waxaad walaalahaa
u qaaddaa eefaah hadhuudhkan duban ah, iyo tobankan
xabbadood ee kibista ah, oo haddiiba xeradii u qaad oo
walaalahaa u gee, 18 oo tobankan xabbadood ee burcadka
ahna waxaad u geeysaa kun-u-taliyahooda, oo soo eeg
sida walaalahaa xaalkoodu yahay, warkooda oo xaqiiqa
ahna ii keen. 19 Haddaba Saa'uul, iyo iyagii, iyo raggii reer
binu Israa'iil oo dhammu, waxay joogeen dooxadii Eelaah,
iyagoo reer Falastiin la diriraya. 20 Markaasaa Daa'uud
aroor hore kacay, oo wuxuu idihii kaga tegey mid dhawra;
dabadeedna intuu tegey ayuu qaaday wixii Yesay ku amray.
Markaasuu yimid meeshii gaadhifardoodku tubnaa, intii
ciidankii goobta dagaalka u baxayay ay dirirta u qaylinayeen.
21 Oo reer binu Israa'iil iyo reer Falastiin dagaal bay isugu
soo diyaariyeen, iyadoo ciidanba ciidanka kale ka gees
yahay. 22 Oo Daa'uud wuxuu alaabtiisii kaga tegey kii alaabta
dhawrayay gacantiisii, wuuna ku orday ciidankii, oo intuu
walaalihiis u tegey ayuu salaamay. 23 Oo intuu walaalihiis la
hadlayay, bal eeg, waxaa soo baxay tiirrigii reer Falastiin ee
Gad ka yimid, ee magiciisa Goli'ad la odhan jiray, isagoo ka
soo dhex baxay safafkii reer Falastiin, oo wuxuu ku hadlay
erayadiisii hore oo kale; Daa'uudna taas wuu maqlay. 24 Oo
raggii reer binu Israa'iil oo dhammu markii ay ninkii arkeen
ayay ka carareen, aad bayna uga cabsadeen. 25 Oo raggii
reer binu Israa'iilna waxay yidhaahdeen, War ma aragteen
ninkan soo baxay? Hubaal wuxuu u soo baxay inuu reer binu
Israa'iil careeyo; oo waxay noqon doontaa in ninkii isaga
dila uu boqorku taajir ka dhigi doono oo maal badan siin
doono; gabadhiisuuna siin doonaa, oo reerka aabbihiisna
ku dhex xorayn doonaa reer binu Israa'iil. 26 Markaasaa
Daa'uud raggii dhinaciisa taagnaa la hadlay, oo ku yidhi,
Ninkii dila midkan reer Falastiin, oo ceebta ka qaada reer
binu Israa'iil, maxaa lagu samayn doonaa? Oo bal yuu yahay
buuryoqabkan reer Falastiin ee Ilaaha nool ciidammadiisa
caraysan karaa? 27 Oo dadkiina waxay ugu jawaabeen,
oo ku yidhaahdeen, Sidan baa lagu samayn doonaa ninkii
dila. 28 Oo markuu ragga la hadlayay Elii'aab oo ahaa
walaalkiisii ugu weynaa ayaa maqlay, oo Elii'aabna aad buu
ugu cadhooday Daa'uud oo wuxuu ku yidhi, War maxaad u
soo dhaadhacday? Oo bal yaad uga soo kacday xayntii idaha
ahayd oo cidlada joogtay? Anigu waan aqaan kibirkaaga,
iyo xumaanta qalbigaaga ku jirta, waayo, waxaad u timid
inaad dagaalka fiirsato. 29 Markaasaa Daa'uud ku yidhi, Bal
maxaan haatan sameeyey? Sow hadal uun ma aha? 30
Markaasuu isagii uga jeestay mid kale, oo sidii oo kaluu
kula hadlay; oo dadkiina sidii hore oo kalay ugu jawaabeen.
31 Oo erayadii Daa'uud ku hadlay markii la maqlay ayaa
Saa'uul loo warramay, oo isna wuu u soo cid diray. 32 Oo
Daa'uudna wuxuu Saa'uul ku yidhi, Ninna yuusan u cabsan
isaga aawadiis; anoo addoonkaaga ah ayaan u tegi doonaa
oo la diriri doonaa midkan reer Falastiin. 33 Oo Saa'uulna
wuxuu Daa'uud ku yidhi, Adigu ma awoodid inaad la dirirto
midkan reer Falastiin, waayo, waxaad tahay wiil yar, isna
dagaalyahan buu ahaa tan iyo yaraantiisii. 34 Oo Daa'uudna
wuxuu Saa'uul ku yidhi, Anoo addoonkaaga ah waxaan hayn
jiray idaha aabbahay, oo haddii libaax ama orso yimaado,
oo idaha nayl yar ka qaato, 35 waan ka daba ordi jiray, oo
intaan wax ku dhufto ayaan afkiisa ka soo bixin jiray; oo
hadduu igu soo boodana intaan gadhka ku dhego ayaan dili
jiray. 36 Anoo addoonkaaga ah libaaxii iyo orsadiiba waan
dilay; oo midkan reer Falastiin oo buuryoqabka ahuna iyagoo
kaluu noqon doonaa, waayo, wuxuu careeyey ciidammadii
Ilaaha nool. 37 Oo Daa'uud wuxuu haddana yidhi, Rabbiga
iga samatabbixiyey ciddiyihii libaaxa iyo ciddiyihii orsada
ayaa haddana iga samatabbixin doona gacanta midkan reer
Falastiin. Markaasaa Saa'uul wuxuu Daa'uud ku yidhi, Tag,
Rabbigu ha kula jiree. 38 Markaasaa Saa'uul Daa'uud u
xidhay dharkiisii, oo madaxiisana u saaray koofiyad naxaas
ah, oo wuxuu kaloo huwiyey dhar bir ah. 39 Oo Daa'uudna
seeftii buu ku kor xidhay dharkiisii, oo wuxuu isku dayay
inuu socdo, waayo, ma uu tijaabin. Markaasaa Daa'uud
wuxuu Saa'uul ku yidhi, Kuwan kuma socon karo; waayo, ma
aanan tijaabin. Markaasaa Daa'uud iska dhigay. 40 Wuxuuse
gacanta ku qaatay ushiisii, oo biyo mareenkuu ka sii doortay
shan dhagax oo siman, oo wuxuu ku ritay kolaygii adhijirka
ee uu haystay, kaasoo ahaa qandigiisii, oo wadhafkiisiina
gacantuu ugu jiray; markaasuu u soo dhowaaday ninkii
reer Falastiin. 41 Oo ninkii reer Falastiinna Daa'uud buu
u soo dhowaaday; ninkii gaashaanka u sidayna wuu hor
socday. 42 Oo markii kii reer Falastiin wax fiiriyey, wuxuu
arkay Daa'uud, wuuna quudhsaday; waayo, wuxuu ahaa

wiil yar uun, oo cas, oo soojeed qurxoon. 43 Markaasaa
kii reer Falastiin wuxuu Daa'uud ku yidhi, War anigu ma
eey baan ahay waadiga ulo ii soo qaataye? Oo kii reer
Falastiin Daa'uud buu ku habaaray magacyadii ilaahyadiisii.
44 Kii reer Falastiinna wuxuu Daa'uud ku yidhi, Ii kaalay oo
hilibkaagaan siin doonaa haadka hawada iyo dugaagga
duurka. 45 Markaasuu Daa'uud kii reer Falastiin ku yidhi,
Adigu waxaad ii soo qaadatay seef iyo waran iyo hoto;
aniguse waxaan kuula imid magaca Rabbiga ciidammada,
kaasoo ah Ilaaha ciidammada reer binu Israa'iil ee aad
caraysiisay. 46 Maanta Rabbigu gacantayduu ii soo kaa
gelin doonaa; waanan ku dili doonaa, oo madaxaanan kaa
gooyn doonaa; oo maanta meydka reer Falastiin ciidankooda
waxaan siin doonaa haadka hawada, iyo dugaagga dhulka,
si dunida oo dhammu ay u ogaato in Ilaah ku dhex jiro reer
binu Israa'iil; 47 iyo si uu shirkan oo dhammu u ogaado inaan
Rabbigu wax ku badbaadin seef iyo waran; waayo, dagaalka
Rabbigaa leh, oo gacantayaduu idinku soo ridi doonaa. 48
Oo markii kii reer Falastiin soo kacay oo uu u soo dhowaaday
inuu Daa'uud ka hor tago, ayaa Daa'uud soo dhaqsaday
oo ku soo orday xaggii ciidanka inuu ka hor tago kii reer
Falastiin. 49 Markaasaa Daa'uud gacanta geliyey kolaygiisii,
oo dhagax kala soo baxay, oo intuu wadhfiyey ayuu kii reer
Falastiin wejiga kaga dhuftay, oo dhagaxiina wejigiisuu dalaq
yidhi, markaasuu dhulka afgembi ugu dhacay. 50 Sidaasuu
Daa'uud kii reer Falastiin kaga adkaaday wadhaf iyo dhagax,
oo wuu ku dhuftay, wuuna dilay; laakiinse Daa'uud gacanta
seefu uguma jirin. 51 Markaasaa Daa'uud orday oo ag
istaagay kii reer Falastiin, oo wuxuu ka qaatay seeftiisii, oo
galkii ka soo bixiyey, oo intuu ku bireeyey ayuu madaxiina
kaga gooyay. Oo kuwii reer Falastiinna markay arkeen in
tiirrigoodii dhintay ayay carareen. 52 Markaasay raggii reer
binu Israa'iil iyo raggii reer Yahuudah kaceen oo qayliyeen
oo waxay eryadeen reer Falastiin, tan iyo dooxadii iyo
ilaa irdaha Ceqroon. Oo dhaawicii reer Falastiinna waxay
ku dhaceen jidka Shacarayim, iyo tan iyo Gad iyo ilaa
Ceqroon. 53 Oo reer binu Israa'iilna way ka noqdeen reer
Falastiinkii ay eryanayeen, oo xeradoodiina way dhaceen.
54 Markaasaa Daa'uud madaxii kii reer Falastiin qaaday,
oo Yeruusaalem keenay, laakiinse hubkiisii teendhadiisuu
dhigay. 55 Oo Saa'uulna markuu arkay Daa'uud oo u baxaya
kii reer Falastiin ayuu Abneer oo ahaa sirkaalkii ciidanka ku
yidhi, Abneer, yarkanu waa ina ayo? Oo Abneerna wuxuu ku
yidhi, Boqorow, noloshaadaan ku dhaartaye, kuuma sheegi
karo. 56 Markaasaa boqorkii wuxuu ku yidhi, Soo haybso
yarka ina ayihiisa. 57 Oo markii Daa'uud ka soo noqday
diliddii kii reer Falastiin ayaa Abneer kexeeyey oo Saa'uul
hor keenay isagoo gacanta ku wata madaxii kii reer Falastiin.
58 Markaasaa Saa'uul ku yidhi, Inanyahow, ina ayaad tahay?
Oo Daa'uudna wuxuu ugu jawaabay, Waxaan ahay wiilkii
addoonkaaga Yesay ee reer Beytlaxam.

18 Oo markii uu dhammeeyey lahadliddii uu Saa'uul la
hadlayay ayay naftii Yoonaataan ku xidhantay naftii
Daa'uud, oo Yoonaataan wuxuu isaga u jeclaaday sidii
naftiisa. 2 Oo maalintaasaa Saa'uul qaatay oo mar dambena
uma uu oggolaan inuu gurigii aabbihiis tago. 3 Markaasaa
Yoonaataan iyo Daa'uud axdi dhigteen, maxaa yeelay, wuxuu
isaga u jeclaaday sidii naftiisii. 4 Markaasaa Yoonaataan
iska bixiyey khamiiskiisii uu huwanaa, oo Daa'uud siiyey,
iyo dharkiisii, iyo xataa seeftiisii, iyo qaansadiisii, iyo
suundhabarkiisii. 5 Oo Daa'uudna meel alla meeshii Saa'uul
u diro ayuu tegi jiray, wuuna ku guulaysan jiray; oo Saa'uulna
wuxuu madax uga dhigay raggii dagaalka, oo taasuna
way la wanaagsanayd dadkii oo dhan iyo addoommadii
Saa'uul oo dhanba. 6 Oo markay yimaadeen, markii Daa'uud
ka soo noqday layntii reer Falastiin, dumarkii baa waxay
ka yimaadeen magaalooyinkii reer binu Israa'iil oo dhan
si ay Boqor Saa'uul uga hor tagaan iyagoo gabyaya oo
cayaaraya, oo faraxsan oo daf iyo alaabtii muusikada
tumaya. 7 Oo dumarkiina midba midda kalay gabay u
celisay, iyagoo cayaaraya, oo waxay yidhaahdeen, Saa'uul
wuxuu laayay kumanyaalkiisii, Daa'uudna wuxuu laayay
tobanyaalkiisii kun. 8 Saa'uulna aad buu u cadhooday,
oo hadalkaas ayuu ka xumaaday, wuxuuna yidhi, Waxay
Daa'uud ku sheegeen tobanyaal kun, laakiinse aniga waxay
igu sheegeen kumanyaal; oo maxaa intaas ka badan oo
uu heli lahaa boqortooyada mooyaane? 9 Oo Saa'uulna
maalintaas dabadeed Daa'uud si xun buu u fiirin jiray. 10 Oo
subaxdii dambe ruux xun oo xag Ilaah ka yimid ayaa ku
soo degay Saa'uul, oo sidii nebi ayuu wax ugu sii sheegay
guriga dhexdiisa. Markaasaa Daa'uud wuxuu gacanta ku
dhuftay kataarad siduu maalin walba yeeli jiray; oo Saa'uulna
gacantuu ku haystay warankiisii. 11 Oo wuxuu yidhi, Daa'uud
derbigaan ku qodbi doonaa. Markaasaa Saa'uul warankii
ku soo ganay. Daa'uudna laba jeer buu ka gabbaday. 12
Oo Saa'uulna Daa'uud buu ka cabsanayay, maxaa yeelay,
Rabbigaa isaga la jiray, wuuna ka tegey Saa'uul. 13 Sidaas
daraaddeed Saa'uul wuu iska fogeeyey isagii, oo wuxuu ka
dhigay sirkaal kun u taliya; isaguna dadka hortiisuu ka bixi
jiray, soona geli jiray. 14 Oo Daa'uudna wuu ku guulaysan jiray
socodkiisa oo dhan, Rabbiguna wuu la jiray. 15 Oo Saa'uulna
markuu arkay in Daa'uud aad u guulaystay ayuu la yaabay.
16 Laakiinse reer binu Israa'iil iyo reer Yahuudah oo dhanba

Daa'uud aad bay u jeclaayeen; waayo, isagu hortooduu ka
bixi jiray, soona geli jiray. 17 Oo Saa'uulna wuxuu Daa'uud
ku yidhi, Bal eeg, gabadhayda weyn oo Meerab ah ayaan
kuu siinayaa inaad guursato; laakiinse waa inaad ii xoog
badnaato oo aad dagaallada Rabbigana dirirto. Waayo,
Saa'uul wuxuu isyidhi, Yuusan gacantayda ku bixin, laakiinse
gacanta reer Falastiin ha ku baxo. 18 Markaasaa Daa'uudna
wuxuu Saa'uul ku yidhi, War yaan ahay, oo noloshaydu
waa maxay, amase reer aabbahay xaggay ka joogaan
reer binu Israa'iil, inaan ahaado wiilkii boqorku soddogga u
ahaa? 19 Laakiinse wakhtigii Saa'uul gabadhiisii Meerab
ahayd Daa'uud loo guurin lahaa, waxaa la siiyey oo loo
guuriyey Cadrii'eel oo reer Mexolaad ahaa. 20 Oo gabadhii
Saa'uul oo Miikaal ahayd ayaa Daa'uud jeclaatay. Markaasaa
Saa'uul loo sheegay, oo taasuna isagii way ka farxisay. 21
Markaasaa Saa'uul wuxuu isyidhi, Dabin ha ku noqotee,
isaga waan siin iyada, si ay gacanta reer Falastiin isaga
gees uga ahaato. Sidaas aawadeed Saa'uul wuxuu Daa'uud
ku yidhi, Adigu maanta waxaad mar labaad noqonaysaa
wiilkii aan soddogga u ahaa. 22 Markaasaa Saa'uul wuxuu
addoommadiisii ku amray oo ku yidhi, Daa'uud hoos ahaan
ula hadla, oo waxaad ku tidhaahdaan, Bal eeg, boqorku wuu
kugu farxay, oo addoommadiisa oo dhammuna way ku jecel
yihiin; haddaba sidaas daraaddeed boqorku soddog ha kuu
noqdo. 23 Oo addoommadii Saa'uulna erayadaas waxay u
sheegeen Daa'uud. Oo Daa'uudna wuxuu yidhi, Ma waxay
idinla tahay inay fudud dahay inaan ahaado wiilkii boqorku
soddogga u ahaa, anigoo ah nin miskiin ah oo weliba
derejo yar? 24 Oo Saa'uul addoommadiisiina way u soo
sheegeen oo ku yidhaahdeen, Daa'uud sidaasuu u hadlay.
25 Markaasaa Saa'uul wuxuu yidhi, Sidan Daa'uud ku dhaha,
Boqorku waxba yarad kaa dooni maayo, boqol buuryo oo
reer Falastiin oo boqorka cadaawayaashiisa looga aarguto
mooyaane. Haddaba Saa'uul wuxuu damcay inuu Daa'uud u
gacangeliyo reer Falastiin. 26 Oo addoommadiisiina markay
Daa'uud erayadaas u soo sheegeen ayaa Daa'uud aad
ugu farxay inuu ahaado wiilkii boqorku soddogga u ahaa.
Maalmahaasuna ma ay dhammaan; 27 markaasaa Daa'uud
kacay oo tegey isagii iyo raggiisiiba, oo waxay reer Falastiin
ka soo laayeen laba boqol oo nin; markaasaa Daa'uud
buuryadoodii keenay, oo boqorkii bay siiyeen tiradoodii oo
dhan, si Daa'uud u noqdo wiilkii boqorku soddogga u ahaa.
Saa'uulna wuu siiyey gabadhiisii Miikaal inay naag u noqoto.
28 Oo Saa'uulna wuu arkay wuuna ogaa in Rabbigu Daa'uud
la jiro; oo Saa'uul gabadhiisii Miikaal ahaydna Daa'uud bay
caashaqday. 29 Saa'uulna aad buu uga sii cabsanayay
Daa'uud; oo Saa'uulna had iyo goorba Daa'uud cadow buu
u ahaa. 30 Markaasaa waxaa soo baxay amiirradii reer
Falastiin; oo sidii ay marar badan u soo bixi jireen, ayaa
Daa'uud ka sii guul badnaa addoommadii Saa'uul oo dhan;
oo sidaas aawadeed magiciisii aad iyo aad buu caan u
noqday.

**19** Markaasaa Saa'uul la hadlay wiilkiisii Yoonaataan iyo
addoommadiisii oo dhan, oo wuxuu ku amray inay
Daa'uud dilaan. 2 Laakiinse Saa'uul wiilkiisii Yoonaataan
ahaa Daa'uud aad buu ugu farxay. Markaasaa Yoonaataan
wuxuu Daa'uud u sheegay oo ku yidhi, Aabbahay Saa'uul
wuxuu doonayaa inuu ku dilo. Haddaba waan ku baryayaaye,
subaxdii digtoonow, oo intaad meel qarsoon gashid dhuumo;
3 oo anigu waan tegayaa, oo beerta aad ku jirto dhexdeeda
ayaan aabbahay ag istaagayaa, oo xaggaagaan aabbahay
kala hadlayaa, oo hadday wax jiraanna waan kuu soo
sheegayaa. 4 Oo Yoonaataanna wax wanaagsan ayuu
aabbihiis Saa'uul uga sheegay Daa'uud, oo ku yidhi,
Addoonkaaga Daa'uud ha ku dembaabin, maxaa yeelay,
isagu kuguma uu dembaabin, oo shuqulladiisuna xaggaaga
aad bay ugu wanaagsanaayeen, 5 waayo, intuu isku
biimeeyey ayuu kii reer Falastiin dilay, oo Rabbiguna guul
weyn buu u sameeyey reer binu Israa'iil oo dhan. Waad
aragtay, waanad ku faraxday, haddaba maxaad dhiig aan
xaq qabin ugu dembaabaysaa inaad sababla'aan Daa'uud u
disho? 6 Markaasaa Saa'uul maqlay codkii Yoonaataan, oo
wuxuu ku dhaartay nolosha Rabbiga inaan Daa'uud la dilayn.
7 Dabadeedna Yoonaataan Daa'uud buu u yeedhay, oo u
sheegay waxyaalahan oo dhan. Markaasaa Yoonaataan
Daa'uud u keenay Saa'uul, oo uu hor joogay sidii waagii hore.
8 Oo haddana mar kale waxaa dhacay dagaal. Markaasaa
Daa'uud baxay oo la diriray reer Falastiin, oo intuu aad
u laayay ayay ka hor carareen. 9 Oo haddana ruux xun
oo xagga Rabbiga ka yimid ayaa ku soo degay Saa'uul
isagoo gurigiisa dhex fadhiya oo warankiisii gacanta ugu
jiro; markaasaa Daa'uud gacanta ku dhuftay kataaraddii. 10
Oo Saa'uulna wuxuu damcay inuu Daa'uud wareemo oo uu
derbiga ku qodbo; laakiinse wuu ka cararay Saa'uul hortiisii
oo Saa'uul wuxuu warankii ka taagay derbigii. Daa'uudna wuu
cararay, oo habeenkaasuu baxsaday. 11 Markaasaa Saa'uul
rag u diray Daa'uud gurigiisii, oo wuxuu ku yidhi, Dhawra oo
subaxdii isaga dila. Markaasaa Miikaal oo Daa'uud naagtiisii
ahayd ayaa warkii u sheegtay, oo ku tidhi, Haddaadan caawa
naftaada la baxsan, berri waa lagu dilayaa. 12 Haddaba
Miikaal waxay Daa'uud ka dejisay daaqaddii; oo isna intuu
tegey ayuu cararay, waana baxsaday. 13 Markaasaa Miikaal
waxay soo qaadday sanam oo sariirtay saartay, oo waxay

madaxa u dhigtay barkin dhogor riyood ah, waxayna ku
dedday dhar. 14 Oo markii Saa'uul rag u soo diray inay
Daa'uud soo kexeeyaan ayay ku tidhi, Wuu bukaa. 15
Markaasaa Saa'uul raggii soo diray inay Daa'uud soo arkaan,
oo wuxuu ku yidhi, Isagoo sariirta ku jiifa ii keena aan dilee.
16 Oo raggiina markay gurigiisii soo galeen ayay arkeen
sanamkii oo sariirta saaran oo barkin dhogor riyood ahu
madaxa u taal. 17 Kolkaasaa Saa'uul wuxuu Miikaal ku
yidhi, Naa maxaad saas iigu khiyaanaysay oo cadowgayga
u sii daysay inuu baxsado? Miikaalna waxay Saa'uul ugu
jawaabtay, Wuxuu igu yidhi, I sii daa, yaanan ku diline.
18 Haddaba Daa'uud wuu cararay oo wuu baxsaday, oo
wuxuu Samuu'eel ugu yimid Raamaah, oo u sheegay kulli
wixii Saa'uul ku sameeyey oo dhan. Markaasaa isaga iyo
Samuu'eel waxay tageen oo degeen Naayood. 19 Saa'uulna
waa loo soo sheegay, oo lagu yidhi, Daa'uud wuxuu joogaa
Naayood oo Raamaah ku taal. 20 Markaasaa Saa'uul rag u
soo diray inay Daa'uud soo qabtaan; oo iyana markay arkeen
guutadii nebiyada ahayd oo wax sheegaya, iyo Samuu'eel
oo dhex taagan oo madax u ah ayaa ruuxii Rabbigu ku
soo degay raggii Saa'uul soo diray, oo iyana wax bay sii
sheegeen. 21 Oo taas markii Saa'uul loo sheegay ayuu
haddana soo diray rag kale, oo iyana wax bay sii sheegeen.
Oo haddana mar saddexaad ayaa Saa'uul rag kale soo
diray, oo iyana wax bay sii sheegeen. 22 Markaasaa isagiina
Raamaah tegey, oo wuxuu yimid ceelka weyn oo ku yaal
Sekuu, dabadeedna dadkii buu wax weyddiiyey oo ku yidhi,
Samuu'eel iyo Daa'uud xaggee bay joogaan? Oo waxaa
lagu yidhi, Waxay joogaan Naayood oo Raamaah ku taal.
23 Markaasuu wuxuu tegey Naayood oo Raamaah ku taal;
markaasaa isagiina waxaa ku soo degay ruuxii Ilaah, oo
wuu sii socday, oo sidii nebi buu wax u sheegay tan iyo
ilaa uu yimid Naayood oo Raamaah ku taal. 24 Oo isna
dharkii buu iska siibay, oo Samuu'eel hortiisuu wax ku sii
sheegay, oo halkaasuu jiifay isagoo qaawan maalintii oo
dhan iyo habeenkii oo dhan. Oo sidaas daraaddeed waxay
yidhaahdaan, Saa'uulna ma nebiyaduu ka mid yahay?

**20** Markaasaa Daa'uud wuxuu ka cararay Naayood oo
Raamaah ku taal, oo intuu Yoonaataan u yimid ayuu
ku yidhi, War maxaan sameeyey? Oo dembigaygu waa
maxay? Oo dembiga aan aabbahaa ku sameeyey ee uu
naftayda u doonayaa waa maxay? 2 Oo isna wuxuu ku
yidhi, Yaanay noqon, adigu dhiman maysid. Aabbahay
wax yar iyo wax weyn toona ma sameeyo wixii uu daaha
iiga qaaday mooyaane. Maxaa aabbahay waxaas oo kale
iiga qarinaya? Saas ma aha. 3 Oo haddana Daa'uud
wuu dhaartay oo yidhi, Aabbahaa aad buu u og yahay
inaad raalli iga tahay; oo wuxuu isyidhaahdaa, Yuusan
Yoonaataan tan ogaanin waaba intaasoo uu ka calool
xumaadaaye; laakiinse sida runta ah, waxaan ku dhaartay
Rabbiga noloshiisa iyo adiga naftaada inaan aniga iyo
dhimasho waxba noo dhaxayn tallaabo mooyaane. 4
Markaasaa Yoonaataan wuxuu Daa'uud ku yidhi, Wax alla
wixii naftaadu jeceshahayba waan kuu samayn doonaa. 5
Oo Daa'uudna Yoonaataan buu ku yidhi, Bal eeg, berrito bil
baa dhalanaysa, oo waa inaanan ka baaqan inaan boqorka
cunto ula fadhiisto, laakiinse i sii daa, aan tagee, oo aan
ilaa maalinta saddexaad duurka ku dhuuntee. 6 Oo haddii
aabbahaa i waayo, waxaad ku tidhaahdaa, Daa'uud aad buu
fasax ii weyddiistay inuu magaaladiisii Beytlaxam ku ordo;
waayo, ehelkiisii oo dhan ayaa halkaas ku bixinaya allabarigii
sannadka. 7 Hadduu kugu yidhaahdo, Waa hagaag, anoo
addoonkaaga ah nabad baan helayaa. Laakiinse hadduu
cadhoodo, bal ogow inuu shar maaggan yahay. 8 Sidaas
daraaddeed anoo addoonkaaga ah ii roonow; waayo, adigu
waxaad ila dhigatay axdi xagga Rabbiga ah. Laakiinse
haddaan dembi galay, adiguba i dil; bal maxaad aabbahaa
iigu geeynaysaa? 9 Markaasaa Yoonaataan wuxuu yidhi,
Taasu ha kaa fogaato, waayo, haddaan ogahay in aabbahay
maaggan yahay inuu shar kugu sameeyo, sow kuuma soo
sheegeen? 10 Kolkaasaa Daa'uud wuxuu Yoonaataan ku
yidhi, Haddii aabbahaa si xun ugu jawaabo bal yaa ii soo
sheegaya? 11 Oo Yoonaataanna wuxuu Daa'uud ku yidhi,
Kaalay oo ina keen aan duurka tagnee. Oo labadoodiiba
waxay tageen duurka. 12 Markaasaa Yoonaataan wuxuu
Daa'uud ku yidhi, Rabbiga Ilaaha reer binu Israa'iil ahu,
markhaati ha ka ahaado; berrito ama saa dambe haddaa
oo kale, markii aan aabbahay soo calool baadho, hadduu
wanaag kuu qabo, sow kuu soo cid diri maayo, oo daaha
kaaga qaadi maayo wuxuu maaggan yahay oo dhan? 13
Hadday aabbahay ka farxin lahayd inuu shar kugu sameeyo
oo aanan daaha kaaga qaadin, oo aanan weliba ku dirin si
aad nabdoonaan ugu tagtid, Rabbigu saas iyo ka sii daran
ha igu sameeyo; Rabbiguna ha kuula jiro siduu aabbahay
ula jiray oo kale. 14 Waa inaanad raxmadda Rabbiga i tusin
intaan noolahay oo keliya, si aanan u dhiman, 15 laakiinse
raxmaddaada waa inaanad ka gooyn reerkayga weligaa,
oo xataa ma aha markii Rabbigu cadaawayaashaada ka
dhammeeyo dhulka. 16 Sidaasuu Yoonaataan axdi ula
dhigtay reerkii Daa'uud, oo yidhi, Taas wuxuu Rabbigu ka
doonayaa cadaawayaasha Daa'uud gacantooda. 17 Oo
Yoonaataan mar kaluu Daa'uud dhaariyey, jacaylkii uu u
qabay aawadiis, waayo, wuxuu isaga u jeclaa siduu naftiisa
u jeclaa oo kale. 18 Markaasaa Yoonaataan wuxuu isagii

ku yidhi, Berrito bil baa dhalanaysa oo waa lagu waayi
doonaa, maxaa yeelay, kursigaagu wuu madhnaan doonaa.
19 Markaad saddex maalmood joogto dabadeed waa inaad
dhaqsataa oo aad tagtaa halkaad ku dhuumatay markii
xaalkanu dhacay, oo waa inaad sii ag joogtaa dhagixii
Kalategidda. 20 Oo anna waxaan meeshaas dhinaceeda ku
soo gani doonaa saddex fallaadhood, sidii anigoo calaamad
ku ganaya. 21 Oo bal eeg, wiil yar baan u soo diri doonaa, oo
waxaan ku odhan doonaa, Tag oo fallaadhihii soo doondoon.
Haddaba haddaan yarka ku idhaahdo, War fallaadhihii waa
kaa sokeeyaan, soo qaad oo kaalay; waayo, nabad baa
kuu jirta oo waxyeello lama arko, Rabbiga noloshiisaan ku
dhaartaye. 22 Laakiinse haddaan wiilka ku idhaahdo, War
fallaadhihii waa kaa shisheeyaan; markaas iska tag, waayo,
Rabbigu wuu ku diray. 23 Oo xagga xaalkii aynu ka hadalnay,
bal eeg, aniga iyo adiga waxaa inoo dhexeeya Rabbiga
weligiisba. 24 Sidaasaa Daa'uud duurka ugu dhex dhuuntay,
oo markii bishii dhalatay ayaa boqorkii u fadhiistay inuu wax
cuno. 25 Markaasaa boqorkii wuxuu ku fadhiistay kursigiisii,
sidii mararkii hore oo kale, kaasuna wuxuu ahaa kursigii
derbiga ag yiil; oo Yoonaataanna wuu istaagay, Abneerna
wuxuu dhinac fadhiistay Saa'uul, laakiinse meeshii Daa'uud
way madhnayd. 26 Habase yeeshee Saa'uul maalintaas
waxba kuma uu hadlin, waayo, wuxuu u maleeyey in wax ku
dhaceen, oo wuxuu isyidhi, Ma uu nadiifsana, hubaal isagu
ma uu nadiifsana. 27 Oo maalintii ka dambaysay galabtii
bishu dhalatay, taasoo ahayd maalintii labaad, Daa'uud
meeshiisii way madhnayd, markaasaa Saa'uul wuxuu wiilkiisii
Yoonaataan ku yidhi, War wiilka Yesay muxuu cuntada
ugu iman waayay shalay iyo maantaba? 28 Markaasaa
Yoonaataan wuxuu Saa'uul ugu jawaabay, Daa'uud aad
buu fasax ii weyddiistay inuu Beytlaxam tago, 29 oo wuxuu
yidhi, Waan ku baryayaaye, i sii daa, aan tagee, waayo,
ehelkayagii baa magaalada allabari ku leh, oo walaalkay
baa igu amray inaan halkaas joogo, haddaba haddii aad
raalli iiga tahay i sii daa aan tagee oo walaalahay soo arkee,
waan ku baryayaaye. Oo sidaas daraaddeed buu u iman
waayay miiska boqorka. 30 Markaasaa Saa'uul aad ugu
cadhooday Yoonaataan, oo wuxuu ku yidhi, Kaagan naag
qalloocan oo caasiyad ah inankeed ahow, war sow ma aan
ogi inaad wiilka Yesay doorатay adoo ceeb u soo jiidaya
naftaada iyo cawrada hooyadaa? 31 Waayo, inta wiilka
Yesay dhulka ku nool yahay, adiga iyo boqortooyadaada
midna dhismi maayo. Sidaas daraaddeed u cid dir oo soo
kexee, waayo, hubaal wuu dhimanayaa. 32 Markaasaa
Yoonaataan wuxuu u jawaabay aabbihiis Saa'uul oo ku yidhi,
Maxaa loo dilayaa? Oo bal muxuu sameeyey? 33 Kolkaasaa
Saa'uul warankiisii ku soo gantaalay si uu u dilo. Sidaasaa
Yoonaataan taas ku ogaaday in aabbihiis maagganaa inuu
Daa'uud dilo. 34 Oo Yoonaataanna miiskuu kala kacay cadho
kulul, oo bisha maalinteedii labaadna waxba ma cunin,
waayo, wuxuu u calool xumaaday Daa'uud aawadiis, maxaa
yeelay, aabbihiis baa ceeb ku sameeyey. 35 Oo subaxdii
dambe ayuu Yoonaataan duurka tegey wakhtigii uu Daa'uud
la ballamay isagoo wata wiil yar. 36 Markaasuu wiilkii yaraa
ku yidhi, Orod hadda oo soo doondoon fallaadhaha aan
ganayo. Oo intii yarkii sii ordayay ayuu fallaadh shishadiisa
ku ganay. 37 Oo yarkii markuu yimid meeshii Yoonaataan
fallaadhii ku soo ganay ayaa Yoonaataan ka soo daba
qayliyey yarkii, oo ku yidhi, War sow fallaadhii kaama sii
shishayso? 38 Oo haddana Yoonaataan wuxuu ka soo daba
dhawaaqay wiilkii oo ku yidhi, War dheeree oo dhaqso oo
ha joogsan. Markaasaa Yoonaataan yarkiisii soo ururiyey
fallaadhihii oo sayidkiisii u yimid. 39 Laakiin yarku waxba ma
ogayn, Yoonaataan iyo Daa'uud keliya ayaase xaalka ogaa.
40 Markaasaa Yoonaataan hubkiisii yarkii u dhiibay, oo ku
yidhi, Tag, oo magaaladii gee. 41 Oo isla markiiba kolkii yarkii
tegey ayaa Daa'uud ka soo baxay meel Yoonaataan xagga
koonfureed ka ahayd, markaasuu wejiga dhulka ku dhuftay
oo saddex jeer sujuuday, wayna isdhunkadeen oo isla
ooyeen ilaa Daa'uud sii badiyey. 42 Markaasaa Yoonaataan
wuxuu Daa'uud ku yidhi, Nabad ku tag, maxaa yeelay,
labadeennuba waxaynu isugu dhaarannay magaca Rabbiga,
innagoo leh, Rabbigu ha inoo dhexeeyo aniga iyo adiga, iyo
farcankayga iyo farcankaaga weligiisba. Markaasaa Daa'uud
kacay oo tegey, oo Yoonaataanna magaaladuu galay.

**21** Oo markaas dabadeedna Daa'uud wuxuu Nob ugu
yimid wadaadkii Axiimeleg ahaa, oo Axiimelegna
Daa'uud buu ka hor yimid isagoo gariiraya, oo wuxuu isagii
ku yidhi, War maxaa keligaa kaa dhigay oo ninna kuula socon
waayay? 2 Oo Daa'uudna wuxuu wadaadkii Axiimeleg ku
yidhi, Boqorkii baa i amray oo muraad ii soo diray, wuxuuna
igu yidhi, Ninna yuusan waxba ka ogaan muraadka aan kuu
diray, iyo waxa aan kugu amray toona, oo raggii dhallinyarada
ahaana meel baan kula ballamay. 3 Haddaba bal maxaa
gacantaada ku jira? Bal i sii shan xabbadood oo kibis ah
amase wax alla waxa yaal. 4 Markaasaa wadaadkii wuxuu
Daa'uud ugu jawaabay, Kibis la wada cuno gacantayda
kuma jirto, laakiinse waxaa taal kibis quduus ah haddii ragga
dhallinyarada ahu naago ayan taaban. 5 Kolkaasaa Daa'uud
wuxuu wadaadkii ugu jawaabay, Sida runta ah intii saddex
maalmood ah naago waa nalaga dhawray, oo markii aan
soo baxay ragga dhallinyarada ah weelalkoodu quduus bay

ahaayeen, laakiinse in kastoo uu sodcaalku mid caadi ah
yahay, bal maanta intee bay weelalkoodu quduus sii yihiin?
6 Sidaas daraaddeed wadaadkii wuxuu Daa'uud siiyey kibis
quduus ah, waayo, halkaas kibis ma oollin, kibistii tusniinta
mooyaane, taas oo Rabbiga hortiisa laga soo qaaday si
kibis kulul loo dhigo maalinta tii hore laga soo qaado. 7 Oo
maalintaas waxaa halkaas joogay nin ka mid ah Saa'uul
addoommadiisii, oo kaasna Rabbiga hortiisaa lagu hayay,
magiciisuna wuxuu ahaa Do'eeg kii reer Edom, oo wuxuuna
ahaa kii madaxda u ahaa xoolojirrada Saa'uul. 8 Markaasaa
Daa'uud wuxuu Axiimeleg ku yidhi, Waxba miyaanad haynin
waran amase seef? Waayo, sooma aan qaadan seeftaydii
iyo hubkaygii toona, maxaa yeelay, waxaa i soo deddejiyey
muraadkii boqorku ii soo diray. 9 Oo wadaadkiina wuxuu
yidhi, Bal eeg, waxaa halkan eefodka dabadiisa taal iyadoo
maro ku duudduuban seeftii Goli'adkii reer Falastiin, oo
aad dooxii Eelaah ku dishay, oo haddaad doonaysid inaad
taas qaadatid, iska qaado, maxaa yeelay, taas mooyaane
mid kale halkan ma taal. Markaasaa Daa'uud wuxuu yidhi,
Taasoo kaleba ma jirto; ee bal i soo sii. 10 Markaasaa
Daa'uud kacay, oo maalintaas wuxuu u cararay cabsi uu
Saa'uul ka qabay aawadeed, oo wuxuu u tegey Aakiish
oo boqorkii Gad ahaa. 11 Kolkaasaa addoommadii Aakiish
waxay isagii ku yidhaahdeen, War sow kanu ma aha Daa'uud
boqorkii dalka? Oo sow midkoodba midka kale gabay
uguma celin iyagoo cayaaraya oo leh, Saa'uul wuxuu laayay
kumanyaalkiisii, Daa'uudna wuxuu laayay tobanyaalkiisii
kun? 12 Oo Daa'uudna erayadaas qalbiguu ku haystay, oo
aad buuna uga cabsanayay Aakiish oo ahaa boqorkii Gad.
13 Oo markaasuu dabicaddiisii hortooda ku beddelay, oo
wuxuu iska dhigay mid waalan markuu gacmahooda soo
galay, oo wuxuu xagxagtay albaabbadii iridda, oo gadhkana
dhareer buu iskaga daadiyey. 14 Markaasaa Aakiish wuxuu
addoommadiisii ku yidhi, War waad aragtaan inuu ninku
waalan yahay, haddaba bal maxaad iigu keenteen? 15
War ma waxaan u baahanahay niman waalan, oo ma taas
aawadeed baad ninkan u keenteen inuu hortayda isku
waalo? War ma ninkan oo kalaa gurigayga soo gala?

**22** Sidaas daraaddeed Daa'uud halkaas wuu ka tegey
oo wuxuu u baxsaday xagga bohoshii Cadullaam, oo
markii walaalihiis iyo reerkii aabbihiis oo dhammu ay taas
maqleen ayay halkaas isagii ugu tageen. 2 Oo mid kasta
oo cidhiidhi ku jira, iyo mid kasta oo deyn qaba, iyo mid
kasta oo aan raalli ahaynba isagay isu soo urursadeen, oo
isna wuxuu u noqday madax u taliya, oo waxaa isaga la
joogay in ku dhow afar boqol oo nin. 3 Markaasaa Daa'uud
halkaas ka tegey oo Misfaahdii reer Moo'aab u kacay; oo
wuxuu boqorkii reer Moo'aab ku yidhi, Waan ku baryayaaye,
aabbahay iyo hooyaday ha soo baxeen oo ha kula joogeen,
ilaa aan ogaado waxa Ilaah ii samaynayo. 4 Oo wuxuu iyagii
hor keenay boqorkii reer Moo'aab, oo isagay la joogeen
intii Daa'uud dhufayska ku jiray oo dhan. 5 Markaasaa
Nebi Gaad wuxuu Daa'uud ku yidhi, Dhufayska ha ku sii
jirine bax oo waxaad tagtaa dalka Yahuudah. Markaasaa
Daa'uud tegey, oo wuxuu yimid kayntii Xaared. 6 Markaasaa
Saa'uul wuxuu maqlay in Daa'uud iyo raggii la jirayba la soo
arkay; oo Saa'uulna wuxuu joogay Gibecaah, isagoo hoos
fadhiya geed Raamaah ku yaal, oo warankiisiina gacanta
ugu jiro, addoommadiisii oo dhammuna hareero taagan
yihiin. 7 Kolkaasaa Saa'uul wuxuu ku yidhi addoommadiisii
hareerahiisa taagnaa, Bal maqla hadda, kuwiinnan reer
Benyaamiinow, wiilka Yesay miyuu midkiin kastaba siinayaa
beero iyo beero canab ah, oo miyuu kulligiin idinka wada dhigi
doonaa kuwo kun kun u taliya, iyo kuwo boqol boqol u taliya?
8 Ma saasaad kulligiin iigu heshiiseen, oo uu midkiinna iigu
soo sheegi waayay markii wiilkaygu axdi la dhiganayay
wiilka Yesay, oo uu midkiinna ii nixi waayay, wuuna iigu soo
sheegi waayay in wiilkaygu igu kiciyey addoonkayga inuu i
gaado sida maanta oo kale? 9 Markaasaa waxaa jawaabay
Do'eeggii reer Edom oo ag taagnaa Saa'uul addoommadiisa,
oo wuxuu yidhi, Waxaan arkay wiilkii Yesay oo Nob ku
soo socda oo u yimid Axiimeleg ina Axiituub. 10 Oo isna
Rabbiguu wax u weyddiiyey, oo saadna wuu siiyey, oo seeftii
Goli'adkii reer Falastiinna wuu siiyey. 11 Kolkaasaa boqorku
u cid diray in loo yeedho wadaadkii Axiimeleg ee ahaa ina
Axiituub, isagii iyo reerkii aabbihiis oo dhanba, kuwaas oo
ahaa wadaaddadii Nob joogay; oo iyana kulligood boqorkii
bay u yimaadeen. 12 Markaasaa Saa'uul ku yidhi, Bal
hadda maqal, ina Axiituubow. Oo isna wuxuu ugu jawaabay,
Sayidkaygiiyow, waa i kan. 13 Kolkaasaa Saa'uul ku yidhi,
Maxaad iigu heshiiseen, adiga iyo ina Yesay, oo maxaad
u siisay kibista iyo seefta, oo Ilaahna wax ugu weyddiisay
si uu iigu kaco inuu i gaado sida maanta oo kale? 14
Markaasaa Axiimeleg wuxuu boqorkii ugu jawaabay, Bal
yaa addoommadaada ka mid ah oo sida Daa'uud aamin u
ah, kaasoo boqorku soddog u yahay, oo weliba shirkaaga
ka qayb gala, oo reerkaagana sharaf ku leh? 15 Anigu ma
maantaan bilaabay inaan isaga Ilaah wax u weyddiiyo?
Taasu ha iga fogaato. Anigu waxan oo dhan waxba kama
ogi wax yar iyo wax badan toona, haddaba, boqorow,
anigoo addoonkaaga ah iyo reerka aabbahay oo dhanba
waxba ha na saarin. 16 Markaasaa boqorkii wuxuu yidhi,
Axiimelegow, hubaal waad dhimanaysaa adiga iyo reerka

aabbahaa oo dhammuba. 17 Dabadeedna boqorkii wuxuu
waardiyayaashii hareerihiisa taagnaa ku yidhi, Ku jeesta oo
wadaaddada Rabbiga laaya, maxaa yeelay, gacantoodu
Daa'uud bay la jirtaa, oo iyagoo og inuu baxsaday ayayan
ii soo sheegin, laakiinse boqorka addoommadiisii way
diideen inay gacantooda ku fidiyaan oo laayaan wadaaddadii
Rabbiga. 18 Markaasaa boqorkii Do'eeg ku yidhi, Adigu
ku jeeso oo wadaaddada laa. Do'eeggii reer Edomna wuu
ku jeestay oo wadaaddadii laayay, oo maalintaas wuxuu
laayay shan iyo siddeetan qof oo wada qaba eefod dhar
wanaagsan laga sameeyey. 19 Oo magaaladii wadaaddada
oo Nob ahaydna wixii joogay ayuu seef ku laayay. Rag
iyo dumarba, iyo carruur iyo caanonuugba, iyo dibi iyo
dameerro iyo idoba wuxuu ku wada laayay seef. 20 Oo
waxaa ka baxsaday oo Daa'uud ka daba cararay mid ka mid
ah wiilashii Axiimeleg ina Axiituub, magiciisana la odhan
jiray Aabyaataar. 21 Markaasaa Aabyaataar wuxuu Daa'uud
u sheegay in Saa'uul laayay wadaaddadii Rabbiga. 22
Kolkaasaa Daa'uud Aabyaataar ku yidhi, Maalintii Do'eeggii
reer Edom halkaas joogay, waan garanayay inuu Saa'uul
u sheegi doono. Dadkii reerka aabbahaa oo dhan anigaa
dhimashada u soo jiiday. 23 Haddaba aniga ila joog oo ha
cabsan, maxaa yeelay, kii naftayda doona ayaa naftaadana
doonaya, waayo, ammaan waad igula joogi doontaa.

**23** Markaasaa Daa'uud loo sheegay oo lagu yidhi, Reer
Falastiin waxay la dirirayaan reer Qeciilaah iyagoo
ka dhacaya meelihii hadhuudhka lagu tumi jiray. 2 Sidaas
daraaddeed Daa'uud Rabbiguu wax weyddiistay oo yidhi,
Miyaan tagaa oo kuwan reer Falastiin soo laayaa? Oo
Rabbiguna wuxuu Daa'uud ku yidhi, Tag, oo reer Falastiin soo
laa, oo reer Qeciilaah soo badbaadi. 3 Markaasaa Daa'uud
raggiisii waxay ku yidhaahdeen, Bal eeg, annagu halkan oo
ah dalka Yahuudah ayaan ku cabsanaynaa, haddaba intee in
le'eg bay nooga sii daran tahay haddaannu Qeciilaah tagno
oo ciidanka reer Falastiin ku duulno? 4 Oo haddana mar
kale ayaa Daa'uud Rabbiga wax weyddiistay. Markaasaa
Rabbigu ugu jawaabay, Kac, oo ku dhaadhac Qeciilaah,
waayo, reer Falastiin gacantaadaan soo gelin doonaa. 5
Markaasaa Daa'uud iyo raggiisiiba Qeciilaah tageen, oo reer
Falastiin la dirireen, oo waxay ka soo dhaceen lo'doodii,
dad faro badanna way laayeen. Sidaasuu Daa'uud dadkii
Qeciilaah degganaa u badbaadiyey. 6 Oo markii Aabyaataar
oo ina Axiimeleg ahaa Daa'uud ugu soo cararay xagga
Qeciilaah, wuxuu yimid isagoo eefod gacanta ku sita. 7
Oo Saa'uul baa loo soo sheegay in Daa'uud Qeciilaah
yimid. Markaasaa Saa'uul yidhi, Haddaa Ilaah gacanta ii soo
geliyey; waayo, wuxuu ku xidhmay markuu galay magaalo
leh irdo iyo qataarro. 8 Markaasaa Saa'uul dadkiisii oo dhan
dagaal ugu yeedhay inay Qeciilaah ku dhaadhacaan, oo ay
Daa'uud iyo raggiisaba hareereeyaan. 9 Oo Daa'uudna wuu
ogaa in Saa'uul belaayo la damacsan yahay; markaasuu
wadaadkii Aabyaataar ahaa ku yidhi, Halkan eefodka
keen. 10 Markaasaa Daa'uud yidhi, Rabbiyow, Ilaaha reer
binu Israa'iilow, hubaal anoo addoonkaaga ah waxaan
maqlay in Saa'uul doonayo inuu Qeciilaah yimaado, oo uu
magaaladana daraadday u baabbi'iyo. 11 Haddaba dadka
reer Qeciilaah miyey isaga ii gacangelin doonaan? Oo
Saa'uul miyuu soo dhaadhacayaa sidii anoo addoonkaaga
ah aan u maqlay? Rabbiyow, Ilaaha reer binu Israa'iilow,
waan ku baryayaaye, anigoo addoonkaaga ah taas ii sheeg.
Markaasaa Rabbigu ku yidhi, Haah, wuu soo dhaadhici
doonaa. 12 Kolkaasuu Daa'uud yidhi, Haddaba miyey
dadka reer Qeciilaah aniga iyo raggaygaba Saa'uul gacanta
noo gelin doonaan? Rabbigu wuxuu yidhi, Haah, way kuu
gacangelin doonaan. 13 Markaasaa Daa'uud iyo raggiisii
oo lix boqol ku dhowaa kaceen oo Qeciilaah ka baxeen,
oo waxay tageen meel alla meeshii ay tegi kareen. Oo
Saa'uulna waxaa loo soo sheegay in Daa'uud Qeciilaah ka
baxsaday, markaasuu iska daayay inuu u soo baxo. 14 Oo
Daa'uudna wuxuu degganaa dhufaysyada cidlada ku yiil, oo
wuxuu iska joogay dalka buuraha leh ee cidlada ah ee Siif.
Oo Saa'uul baa doondooni jiray maalin kasta, laakiinse Ilaah
gacanta uma soo gelin. 15 Oo Daa'uudna wuxuu arkay in
Saa'uul u soo baxay si uu naftiisa u deydeyo. Daa'uudna
cidlada Siif buu ku jiray, duurka dhexdiisa. 16 Markaasaa
Saa'uul wiilkiisii Yoonaataan ahaa kacay, oo Daa'uud ugu
tegey duurka dhexdiisa, oo gacantiisuu ku xoogeeyey Ilaah.
17 Oo wuxuu isagii ku yidhi, Ha cabsan, waayo, aabbahay
Saa'uul gacantiisu kuma heli doonto; oo adna reer binu
Israa'iil boqor baad u noqon doontaa, oo anna waan kugu
xigi doonaa; taasna aabbahay Saa'uul waa og yahay. 18
Oo labadoodii axdi bay Rabbiga hortiisa ku dhigteen. Oo
Daa'uud wuxuu iska joogay duurkii, Yoonaataanna gurigiisii
buu tegey. 19 Markaasaa Saa'uul waxaa Gibecaah ugu yimid
reer Siif, waxayna ku yidhaahdeen, Daa'uud miyaanu ku
dhuuman dhufaysyada dalkayaga duurka ku yaal, oo ku dhex
yaal buurta Xakiilaah, oo lamadegaanka xaggiisa koonfureed
ku taal? 20 Haddaba, boqorow, soo dhaadhac adigoo aad
u doonaya inaad timaadid; oo annana qaybtayadu wuxuu
ahaan doonaa inaan gacantaada ku soo ridno, boqorow. 21
Markaasaa Saa'uul wuxuu yidhi, Kuwo xagga Rabbiga ka
barakaysan noqda; waayo, idinku waad ii naxariisateen. 22
Haddaba waan idin baryayaaye weliba taga oo sii hubsada,

oo waxaad soo ogaataan oo soo aragtaan meeshuu u caado
leeyahay, iyo kii isaga halkaas ku soo arkay, waayo, waxaa
la ii soo sheegay inuu aad xeelad ugu macaamiloodo. **23**
Sidaas daraaddeed soo arka oo soo wada ogaada meelaha
uu ku gabbado ee uu ku dhuunto oo dhanba, oo mar kale
igu soo noqda idinkoo aad u huba, markaasaan idin raaci
doonaa, oo haddii uu dhulka dhex joogo, waxaan isaga ka
dhex baadhi doonaa kumanyaalka reer Yahuudah oo dhan.
**24** Markaasay Saa'uul hor mareen, oo ay u kaceen xagga
Siif, laakiinse Daa'uud iyo raggiisiiba waxay joogeen cidlada
reer Maacoon ku dhex taal Caraabaah ee lamadegaanka
xaggiisa koonfureed ku taal. **25** Markaasaa Saa'uul iyo
raggiisiiba waxay u soo baxeen inay Daa'uud doondoonaan.
Oo iyana taas bay u sheegeen Daa'uud, sidaas daraaddeed
ayuu u dhaadhacay xagga dhagaxii weynaa, oo cidladii
Maacoon ayuu iska joogay. Oo Saa'uulna markuu taas
maqlay ayuu Daa'uud u eryaday xagga cidladii Maacoon.
**26** Oo Saa'uulna wuxuu maray buurta dhankeedii soke,
Daa'uud iyo raggiisiina waxay mareen buurta dhankeedii
shishe, oo Daa'uudna wuu dhaqsaday inuu u cararo cabsi
uu Saa'uul ka qabo aawadeed, waayo, Saa'uul iyo raggiisii
waxay u hareereeyeen Daa'uud iyo raggiisii inay qabtaan.
**27** Laakiinse wargeeys baa Saa'uul u yimid oo ku yidhi, Soo
dhaqso oo kaalay; waayo, reer Falastiin weerar bay ku soo
kacsheen dalkii. **28** Oo sidaas daraaddeed Saa'uul wuu ka
noqday Daa'uud kii uu eryanayay, oo wuxuu u kacay kuwii
reer Falastiin, sidaas aawadeed waxay meeshaas u bixiyeen
Selac Hammaxleqood. **29** Oo Daa'uudna halkaas wuu ka
tegey, oo iska joogay Ceyn Gedii dhufaysyadeedii.

**24** Kolkii Saa'uul ka soo noqday kuwii reer Falastiin oo
uu raacdaysanayay ayaa loo soo sheegay oo lagu
yidhi, Daa'uud cidlada Ceyn Gedii buu joogaa. **2** Markaasaa
Saa'uul reer binu Israa'iil oo dhan kala baxay saddex kun oo
nin oo la doortay, oo wuxuu Daa'uud iyo raggiisii ka xulayay
dhagaxyadii ay riyodibadeedku joogeen. **3** Markaasuu wuxuu
yimid xeryihii idaha oo jidka ku ag yiil, oo halkaasna waxaa ku
tiil bohol; markaasaa Saa'uul halkaas u galay inuu cagihiisa
qariyo aawadeed. Haddaba Daa'uud iyo raggiisiiba waxay ku
jireen bohosha meelaha ugu sii hooseeya. **4** Oo Daa'uudna
raggiisii waxay ku yidhaahdeen, Bal eeg, maanta waa
maalintii Rabbigu kugu yidhi, Cadowgaaga gacantaadaan
ku soo ridi doonaa, oo waxaad ku samayn doontaa wixii
kula wanaagsan. Markaasaa Daa'uud kacay, oo hoos ahaan
ayuu aayar u gooyay Saa'uul darafkii khamiiskiisa. **5** Oo
waxay hadhow noqotay in Daa'uud qalbigiisii naxdini ku
dhacday, maxaa yeelay, wuxuu gooyay darafkii khamiiskii
Saa'uul. **6** Markaasuu wuxuu raggiisii ku yidhi, Rabbigu ha
iga fogeeyo inaan waxan ku sameeyo sayidkayga kaasoo ah
Rabbiga kiisa subkan, iyo inaan isaga gacanta u qaada,
maxaa yeelay, wuxuu yahay Rabbiga kiisa subkan. **7**
Sidaasaa Daa'uud raggiisii ugu diiday erayadaas, oo umana
uu oggolaan inay Saa'uul ku kacaan. Markaasaa Saa'uul ka
soo baxay bohoshii, oo iska tegey. **8** Oo Daa'uudna mar
dambuu kacay oo bohoshii ka soo baxay, oo wuxuu ka daba
qayliyey Saa'uul, oo ku yidhi, Sayidkaygiiyow, boqorow. Oo
Saa'uulna markuu dib dhugtay ayaa Daa'uud wejiga dhulka
saaray, wuuna sujuuday. **9** Oo Daa'uudna wuxuu Saa'uul ku
yidhi, War maxaad u maqashaa dadka warkiisa intay kugu
yidhaahdaan, Daa'uud wuxuu doonayaa inuu wax ku yeelo?
**10** Bal eeg, maanta indhahaagu way arkeen sida Rabbigu iigu
soo kaa gacangeliyey annagoo godka ku jirna, oo qaarna, Dil,
bay igu yidhaahdeen, laakiinse waan kuu naxay; oo waxaan
idhi, Anigu sayidkayga gacanta u qaadi maayo, maxaa
yeelay, isagu waa Rabbiga kiisa subkan. **11** Bal eeg, aabbow,
bal eeg haddana darafkii khamiiskaaga oo gacantayda ku
jira, waayo, waxaan gooyay darafkii khamiiskaaga, kumana
diline, haddaba ogow inayan gacantayda ku jirin shar iyo
xadgudub toona, oo anna kuguma aanan dembaabin, in
kastoo aad naftayda u gaadaysid inaad iga qaaddid. **12**
Rabbigu aniga iyo adiga ha ina kala xukumo, oo Rabbigu
ha iiga kaa aar gudo, gacantayduse ku taaban mayso. **13**
Sida ay leedahay maahmaahdii dadkii hore, Kii shar ah
waxaa ka soo baxda sharnimo, gacantayduse ku taaban
mayso. **14** Bal boqorkii reer binu Israa'iilow, yaad ka soo
daba baxaysaa? Oo bal yaad eryanaysaa? Ma eey bakhti
ah, mase tagfi? **15** Haddaba Rabbigu aniga iyo adiga
dhexdeenna xaakin ha ka ahaado oo ha inoo garnaqo, oo ha
arko gartayda, gacantaadana ha iga samatabbixiyo. **16** Markii
Daa'uud hadalkaas Saa'uul u dhammeeyey ayaa Saa'uulna
wuxuu yidhi, Wiilkaygii Daa'uudow, kaasu ma codkaagii
baa? Saa'uulna codkiisii kor buu u qaaday oo ooyay. **17**
Kolkaasuu Daa'uud ku yidhi, Aad baad iiga qumman tahay,
waayo, wanaag baad ii fashay, anse xumaan baan kuugu
beddelay. **18** Oo adna maanta waxaad caddaysay sidii aad
si wanaagsan iigula macaamilootay, waayo, markii Rabbigu
gacantaada igu soo riday ima aadan dilin. **19** Waayo, haddii
nin cadowgiisa helo miyuu wanaag ku sii dayn lahaa? Sidaas
daraaddeed tan aad maanta ii samaysay aawadeed Rabbigu
wanaag ha kuugu abaalgudo. **20** Oo hadda bal eeg, hubaal
waan ogahay inaad boqor noqonaysid, iyo in boqortooyada
reer binu Israa'iil gacantaada ku dhismi doonto. **21** Haddaba
bal Rabbiga iigu dhaaro, inaadan gooynayn farcankayga iga
dambeeya, iyo inaadan magacayga reer aabbahay ka dhex

baabbi'inayn. 22 Markaasaa Daa'uud u dhaartay Saa'uul.
Oo Saa'uulna gurigiisii buu tegey, laakiinse Daa'uud iyo
raggiisiiba waxay galeen dhufayskii.

25 Markaasaa waxaa dhintay Samuu'eel, reer binu Israa'iil
oo dhammuna way isu soo wada urureen oo u
baroorteen, oo waxay isagii ku dhex aaseen gurigiisii
Raamaah ku yiil. Daa'uudna wuu kacay oo ku dhaadhacay
cidladii Faaraan. 2 Oo waxaa jiray nin reer Maacoon ahaa
oo ay xoolihiisu Karmel joogeen, oo ninkaasuna aad buu
u weynaa, oo wuxuu lahaa saddex kun oo ido ah iyo
kun riyo ah, oo isna idihiisii ayuu Karmel ku xiirayay. 3
Haddaba ninkaas magiciisu wuxuu ahaa Naabaal, naagtiisa
magaceeduna Abiigayil, oo naagtuna waxay ahayd mid
caqli wanaagsan, aadna u suurad qurxoon, laakiinse ninku
wuxuu ahaa nin qallafsan oo shar sameeya; oo wuxuuna
ahaa reer Kaaleeb. 4 Oo Daa'uud oo cidlada joogay ayaa
maqlay in Naabaal idihiisii xiirayo. 5 Daa'uudna toban nin
oo dhallinyaro ah ayuu diray, oo Daa'uud wuxuu raggii
dhallinyarada ahaa ku yidhi, Orda oo Naabaal ugu taga
Karmel, oo magacayga ku salaama; 6 oo waxaad kaas
barwaaqaysan ku tidhaahdaan, Nabadu ha kuu ahaato,
reerkaagana nabadu ha u ahaato, oo waxaad haysatid oo
dhanna nabadu ha u ahaato. 7 Oo haatan waxaan maqlay
inaad haysatid kuwo ido xiira; adhijirradaadiina way nala
joogayeen, oo annana waxba ma aannu yeelin, oo innaba
wax kama dhinnayn intii ay Karmel joogeen oo dhan. 8 Oo
taas bal raggaaga dhallinyarada ah weyddii, oo way kuu
sheegi doonaan. Taas aawadeed ragga dhallinyarada ah
raalli ka ahow, waayo, maalin wanaagsan baannu kuu nimid,
haddaba waan ku baryayaaye wax alla wixii gacantaada
ku jira soo sii addoommadaada iyo anoo ah inankaaga
Daa'uud. 9 Oo markay Daa'uud raggiisii dhallinyarada ahaa
yimaadeen ayay erayadan oo dhan Naabaal kula hadleen
iyagoo magaca Daa'uud ku hadlaya, dabadeedna way
aamuseen. 10 Markaasaa Naabaal ugu jawaabay Daa'uud
addoommadiisii, Waa ayo Daa'uud? Wiilka Yesayse waa
kuma? Maalmahan waxaa jira addoommo badan oo nin
kastaa ku caasiyooba sayidkiisa. 11 Haddaba miyaan qaadaa
kibistayda, iyo biyahayga, iyo hilibkayga aan u qalay kuwa
idaha ii xiiraya, oo miyaan siiyaa niman aanan aqoon meel
ay ka yimaadeen? 12 Sidaas daraaddeed Daa'uud raggiisii
dhallinyarada ahaa way jeesteen oo dib bay u noqdeen,
oo intay Daa'uud u yimaadeen ayay erayadan oo dhan
u sheegeen. 13 Markaasaa Daa'uud wuxuu raggiisii ku
yidhi, Nin walowba seeftaada xidho. Oo nin waluba seeftiisii
buu xidhay, oo Daa'uudna seeftiisii buu xidhay. Kolkaasaa
waxaa Daa'uud raacay in ku dhow afar boqol oo nin; oo
laba boqolna alaabtii bay la joogeen. 14 Laakiinse raggii
dhallinyarada ahaa midkood ayaa u warramay Naabaal
naagtiisii Abiigayil ahayd oo wuxuu ku yidhi, Bal eeg,
Daa'uud ayaa wargeeys ka soo diray cidlada inay soo
salaamaan sayidkayaga, laakiinse wuu caayay. 15 Laakiinse
nimankaasu way noo wanaagsanaayeen aad iyo aad, oo
waxba nalama yeelin, oo innaba wax nagama dhinnayn intii
aannu la soconnay oo dhan markii aannu duurka joognay.
16 Iyagu habeen iyo maalinba derbi bay noo ahaayeen
intaannu iyaga la joognay oo idaha haynay oo dhan. 17
Haddaba bal garo oo ka fiirso wixii aad samayn doonto,
waayo, sayidkayaga iyo reerkiisa oo dhanba belaayaa lala
damacsan yahay, waayo, isagu waa waxmatare, oo ninnaba
lama hadli karo. 18 Markaasaa Abiigayil dhaqsatay, oo
waxay soo qaadatay laba boqol oo xabbadood oo kibis
ah, iyo laba sibraar oo khamri ah, iyo shan neef oo ido ah
oo la qalay, iyo shan koombo oo hadhuudh la dubay ah,
iyo boqol rucubood oo sabiib ah, iyo laba boqol oo fud oo
berde ah, oo waxay ku raratay dameerro. 19 Markaasay
waxay raggeedii dhallinyarada ahaa ku tidhi, Taga oo iga
hor mara, oo anna waan idinka daba imanayaa. Laakiinse
waxba uma ay sheegin ninkeedii Naabaal. 20 Oo siday
dameerkeedii u soo fuushanayd ayay soo dhaadacday
oo ag martay buurta meesheedii qarsoonayd, oo waxaa
ka hor yimid Daa'uud iyo raggiisii, markaasay la kulantay.
21 Haddaba Daa'uud wuxuu markaa ka hor yidhi, Hubaal
waxtarla'aan baan u dhawrayay waxa ninkanu cidlada ku
haysto oo dhan, si aan waxba uga maqnaan waxa uu
leeyahay oo dhan, oo wanaaggii aan u falay shar buu iigu
beddelay. 22 Ilaah saas iyo si ka sii daranba ha ku sameeyo
cadaawayaashayda, haddii waxa uu leeyahay oo dhan
xataa wiil yarna ha noqotee aan ka tago tan iyo waaberiga.
23 Oo Abiigayilna markay Daa'uud aragtay ayay haddiiba
dameerkeedii ka soo degtay, oo Daa'uud isku hor tuurtay,
wayna sujuudday. 24 Oo intay cagihiisa isku tuurtay ayay tidhi,
Dembiganu dushayda ha ahaado, sayidkaygiiyow, dushayda
ha ahaado, oo waan ku baryayaaye, anoo addoontaada
ahu dhegahaaga aan ku hadlo, oo adiguna bal maqal
erayadayda anoo addoontaada ah. 25 Waan ku baryayaaye,
sayidkaygiiyow, ha ka fikirin ninkan waxmataraha ah ee
Naabaal la yidhaahdo, waayo, sida magiciisu u yahay
weeye isaguna; magiciisu waa Naabaal oo waxaa isaga
ku jirta nacasnimo, laakiinse anigoo ah addoontaada ma
aanan arkin nimankii dhallinyarada ahaa oo aad soo dirtay,
sayidkaygiiyow. 26 Sidaas daraaddeed, sayidkaygiiyow,
waxaan ku dhaartay nolosha Rabbiga, iyo adiga naftaada,

maxaa yeelay, Rabbigu wuxuu kaa hor joogsaday inaad
dhiig gasho, iyo inaad gacantaada ku aarsatid, haddaba
cadaawayaashaada iyo kuwa xumaanta kula doonaya,
sayidkaygiiyow, ha noqdeen sida Naabaal oo kale. **27**
Haddaba sayidkaygiiyow, hadiyaddan anoo addoontaada
ah aan kuu keenay, ha la siiyo ragga dhallinyarada ah oo
kula socda. **28** Waan ku baryayaaye, anoo addoontaada ah
xadgudubkayga iga cafi, sayidkaygiiyow, waayo, Rabbigu
hubaal wuxuu kuu samayn doonaa guri ammaan ah,
maxaa yeelay, waxaad dirirtaa dagaallada Rabbiga; oo
cimrigaaga oo dhanna shar lagaama heli doono. **29** Oo
in kastoo dadku kugu kaco oo kuu eryado inuu nafta kaa
qaado, weliba, sayidkaygiiyow, naftaadu waxay xidhmada
nolosha kula xidhnaan doontaa Rabbiga Ilaahaaga ah,
oo cadaawayaashaada naftoodana wuu tuuri doonaa sidii
isagoo ka tuuraya wadhafka meeshiisa godan. **30** Oo markii
Rabbigu kuu sameeyo wanaaggii uu kaaga hadlay oo
dhan ee uu amiir kaaga dhigo reer binu Israa'iil oo dhan,
sayidkaygiiyow, **31** markaas ma nixi doontid, qalbigaaguna
kuuma xumaan doono dhiig aad sababla'aan u daadisay,
iyo aarsasho; oo markii Rabbigu si wanaagsan kuula
macaamiloodo, sayidkaygiiyow, bal markaas i soo xusuuso,
anoo addoontaada ah. **32** Markaasaa Daa'uud wuxuu
Abiigayil ku yidhi, Waxaa mahad leh Rabbiga ah Ilaaha
reer binu Israa'iil oo maanta kuu soo diray inaad iga hor
timaadid. **33** Waxaa barakaysan xigmaddaada, oo adna waad
barakaysan tahay, waayo, waxaad maanta iga celisay inaan
dhiig galo iyo inaan gacantayda ku aarsado. **34** Waxaan ku
dhaartay Rabbiga ah Ilaaha reer binu Israa'iil oo nool oo iga
joojiyey inaan wax ku yeelo, waayo, hubaal haddii aadan
degdegin oo iga hor iman, waaberiga Naabaal xataa wiil yaru
uma uu hadheen. **35** Sidaas daraaddeed Daa'uud gacanteedii
buu ka guddoomay wixii ay u keentay, markaasuu ku yidhi,
Haddaba gurigaagii nabad ku tag, oo bal eeg, codkaagii
waan maqlay, waanan ku aqbalay. **36** Markaasaa Abiigayil u
timid Naabaal, oo bal eeg, gurigiisuu ku qabtay diyaafad
u eg boqor diyaafaddiis, oo Naabaalna qalbigiisu aad buu
u faraxsanaa, waayo, aad buu u sakhraansanaa; sidaas
daraaddeed waxba uma ay sheegin yar iyo badnaan toona
ilaa waaberigii. **37** Oo subaxdii markii Naabaal sakhraankii
ka ba'ay ayay naagtiisii waxyaalahan u sheegtay, markaasaa
qalbigii ku dhex dhintay, oo sidii dhagax oo kale ayuu noqday.
**38** Oo haddana toban maalmood dabadeed Rabbigaa
Naabaal dilay, wuuna iska dhintay. **39** Oo Daa'uudna markuu
maqlay in Naabaal dhintay ayuu yidhi, Waxaa mahad leh
Rabbigii Naabaal caydii uu i caayay iiga soo aarguday, oo
anoo addoonkiisa ah shar iga celiyey; Naabaalna xumaantii
uu samaynayay Rabbigu isaguu ku celiyey. Markaasuu
Daa'uud cid u diray Abiigayil oo kala hadlay siduu u guursan
lahaa. **40** Oo addoommadii Daa'uudna markay Abiigayil ugu
yimaadeen Karmel, intay la hadleen ayay ku yidhaahdeen,
Daa'uud baa noogu kaa soo diray inuu ku guursado. **41**
Markaasay kacday oo intay sujuudday ayay wejigeeda
dhulka saartay, oo waxay tidhi, Bal eeg, anoo addoontaada
ah waxaan ahay midiidin cagaha u maydha addoommada
sayidkayga. **42** Markaasaa Abiigayil dhaqsatay, oo kacday,
oo waxay fuushay dameer, iyadoo wadata shan gabdhood
oo kuweed ah oo la socda; oo iyana wargeeyayaashii
Daa'uud bay daba gashay, waxayna noqotay naagtiisii.
**43** Oo Daa'uud haddana Axiinocamtii reer Yesreceel buu
guursaday, oo labadoodiiba waxay noqdeen naagihiisii. **44**
Haddaba Saa'uul gabadhiisii Miikaal ee Daa'uud naagtiisa
ahayd wuxuu siiyey Faltii oo ahaa ina Layish, kaasoo ahaa
reer Galliim.

**26** Oo waxaa Saa'uul Gibecaah ugu yimid kuwii reer Siif,
iyagoo leh, Miyuusan Daa'uud ku dhuuman buurta
Xakiilaah, oo lamadegaanka ku hor taal? **2** Markaasaa
Saa'uul kacay, oo wuxuu ku dhaadacay cidladii Siif, isagoo
wata saddex kun oo nin oo reer binu Israa'iil laga soo doortay,
inuu Daa'uud ka soo doondoono cidlada Siif. **3** Kolkaasaa
Saa'uul soo degay buurtii Xakiilaah, taasoo lamadegaanka
ku hor taal, waddadana ku dhinac taal. Laakiinse Daa'uud
cidladuu joogay, oo wuxuuna arkay in Saa'uul cidlada uga
soo daba galay. **4** Sidaas daraaddeed Daa'uud basaasyuu
soo diray, wuxuuna ogaaday in Saa'uul xaqiiqa ahaan yimid.
**5** Markaasaa Daa'uud soo kacay oo yimid meeshii Saa'uul
degay, oo Daa'uud wuxuu arkay meeshii Saa'uul jiifay,
isaga iyo Abneer ina Neer oo ahaa sirkaalkii ciidankiisa,
oo Saa'uulna wuxuu jiifay meeshii gaadhifardoodku joogay
dhexdeeda, oo dadkuna hareerihiisay degeen. **6** Markaasaa
Daa'uud jawaabay oo ku yidhi kii reer Xeed oo Axiimeleg
ahaa iyo Abiishay oo ay Seruuyaah dhashay, oo Yoo'aabna
walaalkiis ahaa, oo wuxuu ku yidhi, Yaa ii raacaya Saa'uul
xeraduu joogo? Kolkaasaa Abiishay ku yidhi, anaa ku
raacaya. **7** Sidaasay Daa'uud iyo Abiishay dadkii ugu
yimaadeen habeennimo, oo waxay arkeen Saa'uul oo
hurda meeshii gaadhifardoodka dhexdeeda, oo warankiisiina
dhulkuu ku mudnaa meel madaxiisa u dhow; oo Abneer iyo
dadkiina hareerihiisay jiifeen. **8** Markaasaa Abiishay wuxuu
Daa'uud ku yidhi, Maanta Ilaah wuxuu kuu soo gacangeliyey
cadowgaagii. Haddaba waan ku baryayaaye i daa aan
wareemee oo aan mar keliya dhulka ku qodbee, oo mar
labaad ku dhufan maayo. **9** Markaasaa Daa'uud wuxuu

Abiishay ku yidhi, Ha dilin, waayo, bal yaa gacan u qaadi kara
Rabbiga kiisa subkan, oo haddana eedla'aan doona? **10** Oo
Daa'uudna wuxuu yidhi, Rabbiga noloshiisaan ku dhaartaye,
waxaa isaga dili doona Rabbiga, ama maalintiisii baa iska
iman doonta, amase dagaal buu geli doonaa markaasaa la
dili doonaa. **11** Rabbiga ha iga fogeeyo inaan gacanta u
qaado Rabbiga kiisa subkan. Haddaba waan ku baryayaaye
inoo qaad waranka madaxiisa ag yaal iyo kusadda biyaha,
oo ina keen aannu tagnee. **12** Sidaas aawadeed Daa'uud
wuxuu Saa'uul madaxiisii ka ag qaatay warankii iyo kusaddii
biyaha; kolkaasay tageen, oo ninnaba ma arkin, lamana
ogayn, oo midna ma toosin, waayo, kulligood way wada
hurdeen, maxaa yeelay, waxaa xagga Rabbiga kaga soo
degtay hurdo weyn. **13** Markaasaa Daa'uud dhankii kale u
gudbay oo wuxuu ku dul istaagay buur iyaga in yar ka fog,
oo waxaana u dhexeeyey bannaan weyn. **14** Kolkaasaa
Daa'uud u dhawaaqay dadkii iyo Abneer oo ahaa ina Neer,
oo yidhi, Abneerow, war miyaadan jawaabayn? Markaasaa
Abneer jawaabay oo yidhi, Kaaga boqorka u dhawaaqayaa,
kumaad tahay? **15** Markaasaa Daa'uud wuxuu Abneer ku
yidhi, War sow ma tihid nin rag ah? Yaana kula mid ah
oo reer binu Israa'iil ku jira? Haddaba maxaad u dhawri
weyday sayidkaaga boqorka ah? Waayo, mid dadka ka mid
ah ayaa xerada u galay inuu boqorka sayidkaaga ah dilo.
**16** War waxan aad samaysay ma wanaagsana. Rabbiga
noloshiisaan ku dhaartaye waxaad istaahishaan dhimasho,
maxaa yeelay, ma aydaan dhawrin sayidkiinna ah Rabbiga
kiisa subkan. Haddaba bal fiiriya boqorka warankiisii iyo
kusaddiisii biyaha oo madaxiisa ag yiil. **17** Markaasaa Saa'uul
gartay Daa'uud codkiisii oo yidhi, Wiilkaygii Daa'uudow,
kaasu ma codkaagii baa? Oo Daa'uudna wuxuu yidhi,
Haah, kanu waa codkaygii, boqorow sayidkaygiiyow. **18** Oo
haddana wuxuu yidhi, Sayidkaygiiyow, maxaad ii eryanaysaa,
anoo addoonkaaga ah? Waayo, maxaan sameeyey? Waase
maxay xumaanta gacantayda ku jirtaa? **19** Haddaba waan ku
baryayaaye, boqorow sayidkaygiiyow, bal maqal erayadayda
anoo addoonkaaga ah. Oo haddii Rabbigu igu kaa diray
qurbaan ha aqbalo, laakiinse haddii waxa igu kaa diray ay
binu-aadmi yihiin, Rabbiga hortiisa ha ku inkaarnaadeen,
waayo, maanta way i eryeen si aanan u sii joogin dhaxalkii
Rabbiga, oo waxay igu yidhaahdeen, Tag oo ilaahyo kale u
adeeg. **20** Haddaba sidaas daraaddeed dhiiggaygu yuusan
ku daadan meel Rabbiga hortiisa ka fog, waayo, boqorkii
reer binu Israa'iilow, waxaad u soo baxday si aad tagfi
u doondoonto, oo waa sidii mid buuraha digaagduur ka
ugaadhsanaya. **21** Markaasaa Saa'uul wuxuu yidhi, Waan
dembaabay, wiilkaygii Daa'uudow, iska noqo, waayo, anigu
mar dambe wax ku yeeli maayo, maxaa yeelay, maanta
naftaydu qaali bay kula noqotay. Bal eeg, waan nacasoobay
oo aad iyo aad baan u qaldamay. **22** Markaasaa Daa'uud ugu
jawaabay, Boqorow, waa kan warankaagii! Haddaba ragga
dhallinyarada ah midkood ha u yimaado oo ha kuu qaado.
**23** Oo Rabbiguna nin walba wuu ka abaalmarin doonaa
xaqnimadiisa iyo aaminnimadiisa, waayo, Rabbigu maanta
gacantayduu kugu soo riday, aniguse ma aan doonaynin
inaan gacantayda u qaado Rabbiga kiisa subkan. **24** Oo bal
eeg, sida maanta naftaadu iigu dheeraatay, sidaas oo kale
naftaydu ha ku dheeraato Rabbiga hortiisa, oo dhibaato oo
dhanna ha iga samatabbixiyo. **25** Markaasaa Saa'uul wuxuu
Daa'uud ku yidhi, Wiilkaygii Daa'uudow, waad barakaysan
tahay. Hubaal xoog baad yeelan doontaa, waadna guulaysan
doontaa. Dabadeedna Daa'uud waa iska tegey, Saa'uulna
meeshiisuu ku noqday.

**27** Markaasaa Daa'uud wuxuu isyidhi, Maalin uun baan
gacanta Saa'uul ku dhiman doonaa; haddaba wax iiga
wanaagsan ma jiro inaan dalka reer Falastiin u baxsado
mooyaane; oo Saa'uulna wuu iga quusan doonaa, oo mar
dambe xuduudka reer binu Israa'iil oo dhan igama doondooni
doono; oo saas ayaan gacantiisa kaga baxsan doonaa. **2**
Markaasaa Daa'uud kacay oo gudbay, isagii iyo lixdii boqol
oo nin ee isaga la joogay, oo waxay u yimaadeen Aakiish
oo ahaa ina Maacoog, kaasoo ahaa boqorkii Gad. **3** Oo
Daa'uudna Aakiish buu la joogi jiray Gad, isagii iyo raggiisiiba,
oo nin waluba reerkiisii wuu watay, oo xataa Daa'uud wuu
watay labadiisii naagood, kuwaasoo ahaa Axiinocam tii
reer Yesreceel iyo Abiigayil tii reer Karmel oo Naabaal u
dhaxday. **4** Markaasaa Saa'uul waxaa loo soo sheegay
in Daa'uud u cararay xagga Gad, oo isna mar dambe ma
uusan doondoonin. **5** Kolkaasaa Daa'uud wuxuu Aakiish ku
yidhi, Haddaba haddaad raalli iga tahay, magaalooyinka
duurka ku yaal meel ha iga siiyeen, aan halkaas iska degee,
waayo, bal anoo addoonkaaga ah maxaan magaalada reer
boqor kuula degganahay? **6** Maalintaasaa Aakiish siiyey
Siiqlag, oo sidaas aawadeed Siiqlag ilaa maanta waxaa iska
leh boqorrada dalka Yahuudah. **7** Oo maalmihii Daa'uud
joogay duurka reer Falastiin tiradoodu waxay ahayd sannad
dhan iyo afar bilood. **8** Markaasaa Daa'uud iyo raggiisii u
keceen inay weeraraan reer Geshuur, iyo reer Geser, iyo
reer Camaaleq, waayo, quruumahaas ayaa waagii hore
dalka degganaa, oo waxay degganaayeen ilaa Shuur iyo
xataa tan iyo dalka Masar. **9** Markaasaa Daa'uud dalkii
weeraray, oo nololna kuma uu dayn nin iyo naag toona,
wuxuuna la tegey idihii, iyo dibidii, iyo dameerrihii, iyo geelii,

iyo dharkii, dabadeedna wuu soo noqday, oo Aakiish u
yimid. 10 Markaasaa Aakiish wuxuu ku yidhi, Yaad maanta
soo dhacdeen? Oo Daa'uudna wuxuu yidhi, Waxaannu
weerarnay xagga koonfureed oo dalka Yahuudah, iyo xagga
koonfureed oo reer Yeraxme'eel iyo xagga koonfureed oo
reer Qeyn. 11 Oo Daa'uudna nolol kuma uu dayn nin iyo naag
toona, inuu Gad keeno aawadeed, waayo, wuxuu isyidhi,
Waaba intaasoo ay inagu sheekaystaan oo yidhaahdaan,
Daa'uud saasuu yeelay, caadadiisuna saasay ahayd intuu
duurka reer Falastiin degganaa oo dhan. 12 Aakiishna
Daa'uud buu aaminay, oo wuxuu isyidhi, Isagu dadkiisii
reer binu Israa'iil oo dhan wuu isku diray oo aad bay u
karahsadeen isaga; sidaas daraaddeed isagu wuxuu ii ahaan
doonaa addoon weligiisba.

## 28

Oo wakhtigaas reer Falastiin ciidammadoodii oo dhan
dagaal bay u soo urursadeen inay reer binu Israa'iil
la diriraan. Aakiishna wuxuu Daa'uud ku yidhi, Ogow
inaad adiga iyo raggaaguba dagaalka ii raacaysaan. 2 Oo
Daa'uudna wuxuu Aakiish ku yidhi, Hubaal waad ogaan
doontaa waxa anoo addoonkaaga ah aan samayn doono.
Oo Aakiishna wuxuu Daa'uud ku yidhi, Taas aawadeed
mid madaxayga weligii ilaaliya ayaan kaa dhigayaa. 3 Oo
Samuu'eelna mar hore wuu dhintay, oo reer binu Israa'iil oo
dhammuna way u baroorteen, waxayna ku aaseen Raamaah
taasoo ahayd magaaladiisii. Saa'uulna wuu wada eryay
kuwii ruuxaanta lahaa iyo saaxiriintii oo dhan, oo dalka
wuu ka wada saaray. 4 Oo reer Falastiinna way isa soo
wada urursadeen, oo Shuuneem soo degeen; Saa'uulna
wuxuu soo wada urursaday reer binu Israa'iil oo dhan, oo
iyana waxay soo degeen Gilboca. 5 Saa'uulna markuu
ciidankii reer Falastiin arkay ayuu baqay, aad buuna u
gariiray. 6 Oo Saa'uulna markuu Rabbiga wax weyddiiyey,
Rabbigu uma uu jawaabin, oo riyooyin iyo Uuriim iyo nebiyo
midnaba uguma uu jawaabin. 7 Markaasaa Saa'uul wuxuu
addoommadiisii ku yidhi, War ii doona naag ruuxaan leh,
aan u tago oo wax weyddiiyee. Markaasaa addoommadiisii
waxay ku yidhaahdeen, Naag ruuxaan leh baa Ceyn Door
joogta. 8 Kolkaasaa Saa'uul si kale iska dhigay, dhar kalena
wuu qaatay, wuuna tegey, isagoo laba nin la socda, oo
waxay naagtii u yimaadeen goor habeennimo ah. Markaasuu
ku yidhi, Waan ku baryayaaye, ruuxaanta iila hadal, oo ii soo
kici ku alla kii aan kuu magacaabo. 9 Naagtiina waxay ku
tidhi, Bal eeg, waad og tahay Saa'uul wuxuu sameeyey, iyo
siduu dalka uga saaray kuwii ruuxaanta lahaa, iyo saaxiriintii
oo dhanba. Haddaba bal maxaad dabin iigu dhigaysaa si
aan u dhinto? 10 Markaasaa Saa'uul Rabbiga ugu dhaartay,
oo ku yidhi, Rabbiga noloshiisaan ku dhaartaye inaan waxan
innaba lagugu ciqaabayn. 11 Dabadeedna naagtii waxay
tidhi, Haddaba yaan kuu soo kiciyaa? Wuxuu isna ku yidhi,
Samuu'eel ii soo kici. 12 Oo naagtii markay Samuu'eel
aragtay ayay cod weyn ku qaylisay, oo Saa'uul la hadashay
oo tidhi, War maxaad ii khiyaanaysay? Waayo, Saa'uul baad
tahay. 13 Markaasaa boqorkii wuxuu ku yidhi, Ha cabsan ee
maxaad aragtaa? Naagtiina waxay Saa'uul ku tidhi, Waxaan
arkaa ilaahyo dhulka ka soo baxaya. 14 Isna wuxuu ku
yidhi, Muxuu u eg yahay? Markaasay tidhi, Waxaa soo
baxaya nin oday ah oo huwis huwan. Kolkaasaa Saa'uul
wuxuu ogaaday inuu kaasu Samuu'eel yahay, wejiguuna
dhulka saaray, wuuna u sujuuday. 15 Markaasaa Samuu'eel
Saa'uul ku yidhi, War maxaad ii soo dhibtay oo ii soo kicisay?
Markaasaa Saa'uul wuxuu ugu jawaabay, Anigu aad baan
u dhibbanahay; waayo, reer Falastiin baa ila dagaallama,
oo Ilaahna waa iga tegey, oo marna iima jawaabo, oo
nebiyo iyo riyooyin midna igulama hadlo, sidaas daraaddeed
ayaan kuugu yeedhay, inaad i ogeysiisid waxaan sameeyo.
16 Markaasaa Samuu'eel wuxuu yidhi, War adoo og in
Rabbigu kaa tegey oo uu col kuu noqday, maxaad wax ii
weyddiinaysaa? 17 Oo Rabbiguna wuxuu samaystay wixii uu
iga hadlay, oo Rabbiguna boqortooyadii gacantaada wuu ka
dillaaciyey, oo wuxuu siiyey deriskaaga kaaso ah Daa'uud.
18 Maxaa yeelay, waad addeeci weyday Rabbiga codkiisii,
cadhadiisii weynaydna Camaaleq waad ku dili weyday, oo
sidaas daraaddeed baa Rabbigu maanta waxan kuugu
sameeyey. 19 Oo weliba Rabbigu wuxuu adiga iyo reer
binu Israa'iilba u gacangelin doonaa reer Falastiin. Berrito
adiga iyo wiilashaaduba anigaad ila joogi doontaan. Oo
Rabbiguna wuxuu ciidanka reer binu Israa'iil ku ridi doonaa
gacanta reer Falastiin. 20 Markaasaa Saa'uul haddiiba
kulligiis dhulka ku dhacay, oo aad buu u cabsaday erayadii
Samuu'eel aawadood, oo itaalna kuma jirin, waayo, waxba
ma uu cunin maalintii oo dhan iyo habeenkii oo dhanba. 21
Markaasaa naagtii u timid Saa'uul oo aragtay inuu aad u
naxsanaa, oo waxay ku tidhi, Bal eeg, anoo addoontaada ah
codkaagii baan maqlay, oo anna naftaydii baan biimeeyey,
erayadii aad igula hadashayna waan maqlay. 22 Haddaba
waan ku baryayaaye, bal adna codkayga maqal anoo
addoontaada ah, oo in yar oo kibis ah aan hortaada dhigo,
oo adna cun si markaad tagtid aad xoog u yeelatid. 23
Laakiinse wuu diiday, oo wuxuu yidhi, Anigu waxba cuni
maayo. Laakiinse addoommadiisii ayaa naagtii kula qasbay;
markaasuu codkoodii yeelay. Oo intuu dhulkii ka kacay
ayuu sariirtii ku fadhiistay. 24 Oo naagtuna waxay guriga
ku haysatay weyl shilis, kolkaasay haddiiba degdegtay, oo
soo qashay, oo haddana bur soo qaadatay oo cajiintay, oo

waxay ka dubtay kibis aan khamiir lahayn. 25 Dabadeedna
waxay soo hor dhigtay Saa'uul iyo addoommadiisii, wayna
cuneen. Kolkaasay kaceen, oo isla habeenkii bay tageen.

**29** Haddaba reer Falastiin waxay ciidammadoodii oo dhan
ku soo ururiyeen Afeeq, oo reer binu Israa'iilna waxay
soo ag degeen ishii ku tiil Yesreceel. 2 Oo saraakiishii
reer Falastiinna way soo gudbeen iyagoo ah boqol boqol
iyo kun kun, oo Daa'uud iyo raggiisiina iyagoo Aakiish la
socda ayay soo daba galeen. 3 Markaasaa amiirradii reer
Falastiin waxay yidhaahdeen, Kuwan Cibraaniyada ahu
maxay halkan ka samaynayaan? Aakiishna wuxuu amiirradii
reer Falastiin ku yidhi, War kanu sow ma aha Daa'uud oo
ahaa addoonkii boqorka reer binu Israa'iil ee Saa'uul ah,
oo ila joogay maalmahan iyo sannadahanba, oo aanan
innaba xumaan ka helin tan iyo maalintii uu ii yimid ilaa
maantadan? 4 Laakiinse amiirradii reer Falastiin aad bay
ugu cadhoodeen, markaasay amiirradii reer Falastiin ku
yidhaahdeen, War ninkan celi, si uu ugu noqdo meeshiisii
aad u dooratay, oo yuusan dagaalka noo raacin, waaba
intaasoo intaannu dagaalka ku jirno uu col noo noqdaa,
waayo, ninkanu bal muxuu sayidkiisii kula heshiin karaa?
Sow ma aha nimankan madaxyadooda? 5 Kanu sow ma aha
Daa'uud kii ay gabay isugu celceliyeen, iyagoo cayaaraya,
oo leh, Saa'uul wuxuu laayay kumanyaalkiisii, Daa'uudna
wuxuu laayay tobanyaalkiisii kun? 6 Markaasaa Aakiish
Daa'uud u yeedhay, oo ku yidhi, Rabbiga noloshiisaan ku
dhaartaye, adigu waad qummanayd, oo markaynu ciidanka
dhex soconnay siibixiddaada iyo soogeliddaaduba hortayda
way ku wanaagsanaayeen, waayo, ilaa maalintii aad ii timid
iyo maantadan la joogo innaba xumaan kuguma aanan
arkin; habase yeeshee saraakiishu raalli kaama aha. 7
Sidaas daraaddeed iska noqo, oo nabad ku tag, yaadan
saraakiisha reer Falastiin calool xumayne. 8 Markaasaa
Daa'uud wuxuu Aakiish ku yidhi, War maxaan sameeyey?
Oo xumaanmaad igu aragtay anoo addoonkaaga ah intii
aan kula joogay iyo ilaa maantadan, oo maxaa laygu diiday
si aanan u tegin oo aanan ula diririn cadaawayaashaada,
boqorow sayidkaygiiyow? 9 Markaasaa Aakiish Daa'uud ugu
jawaabay, Anigu waan ogahay inaad hortayda ku wanaagsan
tahay, oo waxaad iila mid tahay malaa'ig Ilaah, habase
yeeshee amiirradii reer Falastiin waxay yidhaahdeen, Isagu
dagaalka noo raaci maayo. 10 Haddaba aroor hore adiga
iyo sayidkaaga addoommadiisii oo kula socdaaba kaca; oo
aroortii markaad kacdaan oo waagu idiin baryo, taga. 11
Markaasaa Daa'uud iyo raggiisiiba aroor hore keceen, si ay
subaxdii u tagaan, oo ay ugu noqdaan dalkii reer Falastiin.
Oo kuwii reer Falastiinna kor bay ugu sii baxeen xagga
Yesreceel.

**30** Oo maalintii saddexaad intaanay Daa'uud iyo raggiisii
Siiqlag iman ayaa reer Camaaleq soo dhaceen xagga
koonfureed, iyo Siiqlag, oo waxay weerareen Siiqlag,
wayna gubeen; 2 oo waxay la tageen dumarkii iyo kuwii
magaalada ku jiray oo dhan yar iyo weynba. Waxba kama
ay layn, laakiinse way la tageen oo iska baxeen. 3 Oo
Daa'uud iyo raggiisiina markay magaaladii yimaadeen, waxay
arkeen iyadoo la gubay, oo naagahoodii iyo wiilashoodii
iyo gabdhahoodiiba loola wada tegey maxaabiis ahaan. 4
Markaasaa Daa'uud iyo dadkii la jirayba codkoodii kor u
qaadeen oo ooyeen, ilaa ay waayeen itaal ay ku sii ooyaan.
5 Oo Daa'uud labadiisii naagood ee ahaa Axiinocam tii reer
Yesreceel, iyo Abiigayil oo ahayd reer Karmel oo Naabaalna
u dhaxdayba, waa lala tegey iyagoo maxaabiis ah. 6 Oo
Daa'uudna aad buu u dhibtooday, waayo, dadku waxay ku
wada hadleen inay dhagxiyaan, maxaa yeelay, dadkii wuxuu u
wada calool xumaaday nin waluba wiilashiisii iyo gabdhihiisii,
laakiinse Daa'uud wuxuu isku sii dhiirriyey Rabbiga Ilaahiisa
ah. 7 Markaasaa Daa'uud wuxuu wadaadkii ahaa Aabyaataar
ina Axiimeleg ku yidhi, Waan ku baryayaaye eefodka halkan
iigu keen. Aabyaataarna eefodkii buu Daa'uud u keenay. 8
Markaasaa Daa'uud Rabbiga wax weyddiiyey, oo wuxuu
yidhi, Miyaan eryadaa colkan, oo miyaan gaadhayaa? Oo
Rabbiguna wuxuu ugu jawaabay, Haah, eryo, waayo, hubaal
waad gaadhaysaa, oo intii lala tegey oo dhan waad soo
celinaysaa. 9 Sidaas daraaddeed Daa'uud wuu tegey, isagii
iyo lixdii boqol oo nin ee la jirtayba, oo waxay yimaadeen
durdurkii Besoor, oo intii laga tegeyna halkaasay ku hadheen.
10 Laakiinse Daa'uud wuu eryaday, isagoo afar boqol oo
nin wata; waayo, laba boqol ayaa dib u hadhay, kuwaasoo
aad u daalay oo dhaafi kari waayay durdurkii Besoor. 11 Oo
mid Masri ah ayay duurka ka heleen, oo waxay u keeneen
Daa'uud, oo kibisna way siiyeen, wuuna cunay, oo biyo uu
cabbona way siiyeen. 12 Oo waxay kaloo siiyeen fud yar oo
berde ah, iyo laba rucubood oo sabiib ah; oo markuu cunay
ayaa naftii ku soo noqotay, waayo, saddex maalmood iyo
saddex habeen kibisna ma uu cunin, biyona ma uu cabbin.
13 Markaasaa Daa'uud wuxuu ku yidhi, War yaa ku leh? Oo
xaggee baad ka timid? Isna wuxuu yidhi, Waxaan ahay nin
dhallinyar oo Masri ah, oo addoon baan u ahay mid reer
Camaaleq ah. Sayidkaygii baa iga tegey, maxaa yeelay,
saddex maalmood ka hor ayaan bukooday. 14 Oo waxaannu
soo dhacnay reer Kereetiim xaggooda Koonfureed, iyo dalka
ay leeyihiin reer Yahuudah, iyo xagga Koonfureed oo reer

Kaaleeb; oo Siiqlagna waan gubnay. 15 Markaasaa Daa'uud
wuxuu ku yidhi, Colkaas ma ii geeynaysaa? Isna wuxuu
yidhi, Ilaah iigu dhaaro inaadan i dilayn, sayidkaygiina ii
gacangelinayn, oo anna colkaas waan kuu geeynayaa. 16
Oo markuu keenay waxay ku kala firidhsanaayeen dhulka oo
dhan, iyagoo wax cabbaya, oo wax cunaya, oo cayaaraya,
maxaa yeelay, maal badan bay ka soo dhaceen dalkii reer
Falastiin iyo dalkii Yahuudahba. 17 Oo Daa'uudna wuxuu
laynayay iyagii fiidkii ilaa fiidkiisii kale, oo nin iyagii ahuna
ma baxsan, afar boqol oo dhallinyaro ah oo intay awr
fuuleen ku carartay mooyaane. 18 Oo Daa'uudna wuu soo
wada dhiciyey waxay reer Camaaleq la tageen oo dhan;
oo labadiisii naagoodna Daa'uud waa soo badbaadiyey. 19
Oo waxba kama maqnayn iyagii, wax yar iyo wax weyn
toona, ama wiilal iyo gabdho toona, ama booli iyo wixii ay
la tageen oo dhan toona; oo Daa'uudna wuu soo wada
celiyey kulligood. 20 Markaasaa Daa'uud kaxaystay idihii iyo
lo'dii oo dhan, oo waxay ku hor kexeeyeen xoolihii kale, oo
yidhaahdeen, Intanu waa boolidii Daa'uud. 21 Oo Daa'uudna
wuxuu u yimid labadii boqol oo nin oo intay daaleen Daa'uud
raaci kari weyday, oo ay durdurkii Besoor agtiisa kaga
tageen, oo iyana waxay u soo baxeen inay ka hor tagaan
Daa'uud iyo dadkii la jiray; oo Daa'uudna markuu dadkii u
soo dhowaaday ayuu nabdaadiyey. 22 Markaasay raggii
sharka lahaa ee waxmatarayaasha ahaa oo Daa'uud raacay
oo dhammuba waxay ugu jawaabeen, Maalkii aannu soo
dhacsannay iyaga waxba ka siin mayno, maxaa yeelay,
nama ay raacin, laakiinse nin kasta waxaannu siinaynaa
naagtiisii iyo carruurtiisii, ee ha kaxaysteen oo ha iska tageen.
23 Markaasaa Daa'uud wuxuu yidhi, Walaalahayow, waa
inaydnaan saas ku samayn wixii Rabbigu ina siiyey, kaasoo
ah kii ina badbaadiyey, oo weliba inoo soo gacangeliyey
colkii ina soo weeraray. 24 Haddaba bal yaa waxaa idinka
maqlaya? Ka dagaalka u baxaa siduu qayb u helo ayuu
ka alaabta ku hadhaana qayb u helayaa; isku si waa
inay u qaybsadaan. 25 Maalintaas intay ka bilaabanto ilaa
maantadan la joogo, wuxuu taas uga dhigay reer binu Israa'iil,
qaynuun iyo amar. 26 Oo Daa'uudna markuu Siiqlag yimid
ayuu boolidii qaarkeed odayaashii dalkii Yahuudah u diray,
iyo xataa saaxiibbadiis, oo wuxuu ku yidhi, Bal eega, tanu
waa hadiyad ka mid ah boolidii aan cadaawayaashii Rabbiga
ka soo dhacay, 27 oo wuxuu u wada diray kuwii Beytel
joogay, iyo kuwii Raamod tii koonfureed joogay, iyo xataa
kuwii Yatiir joogay, 28 iyo kuwii Carooceer joogay, iyo kuwii
Sifmood joogay, iyo kuwii Eshtemooca joogay, 29 iyo kuwii
Raakaal joogay, iyo kuwii magaalooyinka reer Yeraxme'eel
joogay, iyo kuwii magaalooyinka reer Qeyn joogay, 30 iyo
kuwii Xormaah joogay, iyo kuwii Koor Caashaan joogay, iyo
kuwii Cataag joogay, 31 iyo kuwii Xebroon joogay, oo xataa
wuu u wada diray kuwii joogay meelihii Daa'uud iyo raggiisu
ku noqnoqon jireen oo dhan.

31 Haddaba reer Falastiin waxay la dirireen reer binu
Israa'iil, oo raggii reer binu Israa'iilna way ka carareen
reer Falastiin, oo Buur Gilboca ayay ku daateen iyagoo
la laayay. 2 Oo reer Falastiinna aad bay u eryadeen
Saa'uul iyo wiilashiisii, markaasaa reer Falastiin waxay
dileen Yoonaataan, iyo Abiinaadaab, iyo Melkiishuuca oo
ahaa Saa'uul wiilashiisii. 3 Oo dagaalkiina aad buu ugu sii
kululaaday Saa'uul, oo waxaa isagii gaadhay qaansoleydii,
oo isna qaansoleydii aawadeed ayuu dhib badan ula
kulmay. 4 Markaasaa Saa'uul wuxuu kii hubka u siday ku
yidhi, War seeftaada la soo bax oo iga mudhbixi, waaba
intaasoo buuryoqabyadanu yimaadaan oo ay intay seef iga
mudhbixiyaan i caayaane. Laakiinse kii hubka u siday wuu
diiday, waayo, aad buu u cabsaday. Sidaas daraaddeed
Saa'uul wuxuu qaatay seeftiisii, markaasuu ku dul dhacay. 5
Oo kii hubka u sidayna markuu arkay in Saa'uul dhintay, isna
wuxuu ku dul dhacay seeftiisii, wuuna la dhintay. 6 Sidaas
daraaddeed maalintaas waxaa wada dhintay Saa'uul, iyo
saddexdiisii wiil, iyo kii hubka u siday, iyo raggiisii oo dhan.
7 Oo raggii reer binu Israa'iil oo dooxadii dhankeeda kale
joogay, iyo kuwii Webi Urdun shishadiisa joogay, markay
arkeen in raggii reer binu Israa'iil carareen oo Saa'uul iyo
wiilashiisii ay dhinteen ayay magaalooyinkii ka tageen oo
carareen; markaasaa reer Falastiin yimaadeen oo iska
degeen. 8 Oo maalintii dambe markay reer Falastiin u
yimaadeen inay dharka ka furtaan kuwii la dilay waxay
heleen Saa'uul iyo saddexdiisii wiil oo Buur Gilboca ku
dhintay. 9 Markaasay madaxii ka gooyeen, oo hubkiisiina
way ka furteen, oo waxay u cid direen dalkii reer Falastiin oo
ku wareegsanaa inay u wargeeyaan gurigii sanamyadooda
iyo dadkiiba. 10 Oo hubkiisiina gurigii Cashtarod ayay
dhigeen, meydkiisiina derbigii Beytshaan bay ku xidheen. 11
Oo dadkii Yaabeesh Gilecaad degganaa markay maqleen
waxyaalihii ay reer Falastiin Saa'uul ku sameeyeen, 12
waxaa kacay raggii xoogga lahaa oo dhan, oo habeenkii
oo dhan ayay sii guuraynayeen, markaasay Beytshaan
derbigiisii ka soo qaadeen Saa'uul meydkiisii iyo meydadkii
wiilashiisa, kolkaasay yimaadeen Yaabeesh, oo halkaasay
ku gubeen. 13 Markaasay lafahoodii qaadeen oo ku aaseen
geed Yaabeesh ku yiil hoostiisa, toddoba maalmoodna way
soomeen.

# Samuu'Eel Labaad

1 Dhimashadii Saa'uul dabadeed, markii Daa'uud ka soo
noqday layntii reer Camaaleq oo uu Daa'uud laba
maalmood Siiqlag sii joogay 2 ayaa xataa maalintii saddexaad
nin ka yimid xeradii Saa'uul isagoo maryo jeexjeexan,
madaxana ciidu kaga taal, oo markuu Daa'uud u yimid
ayuu dhulka ku dhacay oo sujuuday. 3 Markaasaa Daa'uud
ku yidhi, Xaggee baad ka timid? Markaasuu isna wuxuu
yidhi, Waxaan ka soo baxsaday xeradii reer binu Israa'iil. 4
Daa'uudna wuxuu ku yidhi, Waan ku baryayaaye, sidee baa
wax u dhaceen? Bal ii sheeg. Oo isna wuxuu ugu jawaabay,
Dadkii dagaalkii way ka carareen, oo dadkii badidiisiina
way le'deen; oo Saa'uul iyo wiilkiisii Yoonaataanba waa
dhinteen. 5 Markaasaa Daa'uud wuxuu ku yidhi ninkii
dhallinyarada ahaa, oo u soo warramay, War sidee baad u
ogaatay in Saa'uul iyo wiilkiisii Yoonaataanba ay dhinteen?
6 Markaasaa ninkii dhallinyarada ahaa oo u soo warramay,
wuxuu ku yidhi, Markaan si lamafilaan ah Buur Gilboca u
soo gaadhay, waxaan arkay Saa'uul oo ku tiirsan warankiisii,
gaadhifardoodkii iyo fardooleydiina aad bay u eryanayeen. 7
Oo markuu gadaashiisa dhugtay ayuu i arkay, oo ii yeedhay.
Oo anna waxaan ugu jawaabay, Waa i kan. 8 Markaasuu
igu yidhi, Yaad tahay? Oo anna waxaan ugu jawaabay, Nin
reer Camaaleq ah baan ahay. 9 Oo isna wuxuu igu yidhi,
Waan ku baryayaaye, bal i soo ag joogso, oo i dil, waayo,
wareer baa i haya; waayo, weli naftii waa igu jirtaa. 10
Saas aawadeed waan ag joogsaday oo waan dilay, maxaa
yeelay, waan hubay markuu dhacay dabadeed inuusan
noolaanayn; oo markaasaan ka soo qaaday taajkii madaxa u
saarnaa, iyo dugaagaddii gacanta ugu jirtay, waanan kuu
keenay, sayidkaygiiyow. 11 Markaasaa Daa'uud dharkiisii
jeexjeexay; oo raggii isaga la jiray oo dhammuna saasoo
kalay wada yeeleen, 12 wayna u baroorteen, oo u ooyeen,
oo u soomeen ilaa fiidkii Saa'uul, iyo wiilkiisii Yoonaataan,
iyo dadkii Rabbiga, iyo reer binu Israa'iil aawadood; maxaa
yeelay, seef bay ku le'deen. 13 Kolkaasaa Daa'uud ku
yidhi ninkii dhallinyarada ahaa oo u soo warramay, Xaggee
baad ka timid? Isna wuxuu ugu jawaabay, Waxaan ahay
nin qalaad wiilkiis oo reer Camaaleq ah. 14 Daa'uudna
wuxuu ku yidhi isagii, Sidee baad uga cabsan weyday
inaad gacantaada u qaaddo Rabbiga kiisa subkan? 15
Dabadeedna Daa'uud wuxuu u yeedhay raggii dhallinyarada
ahaa midkood, oo ku yidhi, U dhowow oo dil. Markaasuu
dilay, isna wuu dhintay. 16 Daa'uudna wuxuu ku yidhi,
Dhiiggaagu madaxaaga ha saarnaado; waayo, afkaagaa
kugu marag furay, oo waxaad tidhi, Rabbiga kiisa subkan
ayaan dilay. 17 Markaasaa Daa'uud baroortan ugu baroortay
Saa'uul iyo wiilkiisii Yoonaataan, 18 oo wuxuu ku amray inay
carruurta dalka Yahuudah baraan gabayga qaansada; oo
bal eeg, kaasu wuxuu ku qoran yahay kitaabka Yaashaar.
19 Reer binu Israa'iilow, Ammaantiinnii waxaa lagu dilay
meelihiinna sarsare! Bal eega kuwa xoogga leh siday
u dhaceen! 20 Haddaba taas Gad ha ku sheegina, Oo
jidadka Ashqeloonna ha ku caddaynina; Waaba intaasoo
ay naagaha reer Falastiin ku farxaane, Waaba intaasoo ay
buuryoqabyada naagahoodu ku guulaystaane. 21 Buuraha
Gilbocow, Dharab iyo roob midna yaan laydinku arkin, beerihii
qurbaanyadu ka bixi jireenna yaanay jirin, Waayo, kuwii
xoogga lahaa gaashaankoodii ayaa halkaas lagu tuuray,
Xataa gaashaankii Saa'uul oo ahaa sida mid aan saliid lagu
subkin. 22 Kuwii la laayay dhiiggoodii, iyo kuwii xoogga
lahaa xaydhoodii, Yoonaataan qaansadiisii dib ugama ay soo
noqon, Oo Saa'uul seeftiisiina madhnaan kuma ay soo noqon.
23 Intay noolaayeen Saa'uul iyo Yoonaataan waxay ahaayeen
kuwo la jecel yahay, oo macaan, Markay dhinteenna, lama
kala geeyn, Gorgorrada way ka dheereeyeen, Libaaxyadana
way ka xoog badnaayeen. 24 Gabdhaha reer binu Israa'iilow,
Saa'uul u ooya, Kii dhar cas si raaxa leh idiin huwiyey, Oo
dharkiinnana dahab ku sharraxay. 25 Kuwii xoogga badnaa
siday dagaalka ugu dhex dhaceen! Yoonaataan waxaa
lagu dilay meelihiinna sarsare. 26 Anigu daraaddaa baan u
dhibtooday, walaalkay Yoonaataanow; Adigu aad baad iigu
macaanayd, Oo jacaylkaad ii qabtay wuxuu ahaa mid yaab
leh, Oo xataa caashaqa naagaha dhaafaya. 27 Bal eeg kuwii
xoogga badnaa siday u dhaceen, Hubkii dagaalkuna siduu u
hallaabay!

2 Markaas dabadeed Daa'uud baa Rabbiga wax weyddiiyey,
oo yidhi, Magaalooyinka dalka Yahuudah middood ma u
kacaa? Rabbiguna wuxuu ku yidhi, Haah, u kac. Markaasaa
Daa'uud yidhi, Xaggee baan u kacaa? Isna wuxuu yidhi,
Xebroon tag. 2 Saas daraaddeed Daa'uud halkaasuu u
kacay, oo labadiisii naagoodna way raaceen, kuwaas oo
ahaa Axiinocam tii reer Yesreceel, iyo Abiigayil oo u dhaxday
Naabaal kii reer Karmel. 3 Oo raggiisii isaga la jirayna
Daa'uud wuu kaxaystay, iyadoo nin waluba reerkiisii wato;
oo waxay degeen magaalooyinkii Xebroon. 4 Markaasaa
dadkii dalka Yahuudah yimid, oo halkaasay Daa'uud ugu
subkeen inuu ahaado boqor u taliya dalka Yahuudah.
Waxaana Daa'uud loo sheegay, oo lagu yidhi, Kuwii Saa'uul
aasay waxay ahaayeen dadka reer Yaabeesh Gilecaad.
5 Markaasaa Daa'uud wargeeyayaal u diray dadkii reer
Yaabeesh Gilecaad, oo ku yidhi, Rabbigu ha idin barakeeyo,

waayo, waad u roonaateen oo aasteen sayidkiinnii Saa'uul
ahaa. 6 Haddaba Rabbigu ha idiin roonaado oo runtana
ha idin tuso; oo anna waan idiinka abaalgudi doonaa
roonaantaas, maxaa yeelay, idinku waxaas baad samayseen.
7 Haddaba gacmihiinnu ha xoogaysteen, oo idinna xoog
yeesha, waayo, sayidkiinnii Saa'uul waa dhintay, oo reer
Yahuudahna anigay ii subkeen inaan u ahaado boqor u
taliya. 8 Haddaba Abneer oo ahaa ina Neer, oo Saa'uul
ciidankiisa sirkaal u ahaa ayaa soo kaxaystay Iishboshed
oo ahaa ina Saa'uul, oo wuxuu u soo gudbiyey xagga
Maxanayim; 9 oo wuxuu boqor uga dhigay reer Gilecaad, iyo
reer Ashuur, iyo Yesreceel, iyo reer Efrayim, iyo Benyaamiin,
iyo reer binu Israa'iil oo dhan. 10 (Oo Iishboshed oo ahaa ina
Saa'uul afartan sannadood buu jiray markii uu bilaabay inuu
boqor u noqdo reer binu Israa'iil, oo wuxuuna boqor u ahaa
laba sannadood.) Laakiinse reer Yahuudah waxay raaceen
Daa'uud. 11 Oo wakhtigii Daa'uud Xebroon boqorka ugu ahaa
reer Yahuudah wuxuu ahaa toddoba sannadood iyo lix bilood.
12 Markaasaa Abneer oo ahaa ina Neer, iyo addoommadii
Iishboshed ina Saa'uul, Maxanayim ka soo baxeen, oo
waxay tageen Gibecoon. 13 Kolkaasaa Yoo'aab oo ay
Seruuyaah dhashay, iyo addoommadii Daa'uud soo baxeen,
oo waxay ku wada kulmeen balligii Gibecoon agtiisa; oo
iyana qolo waxay balliga ka fadhiisatay dhinac, qoladii kalena
waxay balliga ka fadhiisteen dhinacii kale. 14 Markaasaa
Abneer wuxuu Yoo'aab ku yidhi, Waan ku baryayaaye, ragga
dhallinyarada ahu ha kaceen oo horteenna ha ku cayaareen.
Yoo'aabna wuxuu yidhi, Waa yahay ee ha kaceen. 15
Markaasay kaceen oo tiro ku gudbeen; oo waxay ahaayeen
laba iyo toban reer Benyaamiin ah, oo ka socda xaggii
Iishboshed oo ahaa ina Saa'uul, iyo laba iyo toban ka socda
addoommadii Daa'uud. 16 Oo mid waluba ninkiisii ayuu
madaxa qabsaday, oo seeftiisii ayuu dhinaca ka daray midkii
uu haystay. Sidaasay dhammaantood u wada dhaceen. Saas
aawadeed meeshaas oo Gibecoon ku taal waxaa loo baxshay
Xelqad Hasuriim. 17 Oo dagaalkiina aad buu u kululaaday
maalintaas; oo waxaa laga adkaaday Abneer, iyo raggii reer
binu Israa'iil, waxaana ka reeyey addoommadii Daa'uud.
18 Oo saddexdii wiil ee ay Seruuyaah dhashay halkaas
ayay wada joogeen, kuwaasoo ahaa Yoo'aab iyo Abiishay
iyo Casaaheel. Casaaheelna wuxuu u cago fududaa sida
cawsha duurka. 19 Markaasaa Casaaheel wuxuu eryaday
Abneer, oo intuu Abneer eryanayayna uma uu leexan midig
iyo bidix toona. 20 Markaasaa Abneer gadaashiisa dhugtay,
oo wuxuu yidhi, War ma adigii baa, Casaaheelow? Oo
isna wuxuu ugu jawaabay, Haah, waa anigii. 21 Markaasaa
Abneer wuxuu ku yidhi, War midigta ama bidixda u leexo, oo
ragga dhallinyarada ah midkood qabso, oo ka soo qaado
hubkiisa dagaalka. Laakiinse Casaaheel wuu diiday inuu
isaga ka leexdo. 22 Markaasaa Abneer haddana Casaaheel
ku yidhi, War ha i eryane, gees iiga leexo; maxaan dhulka
kuugu dhufanayaa? Haddaba sidee baan wejiga u siin
karayaa walaalkaa Yoo'aab? 23 Habase yeeshee wuu diiday
inuu gees uga leexdo; sidaas daraaddeed Abneer waranka
dabadiisii ayuu caloosha kaga dhuftay, warankiina dib buu
uga mudhbaxay; markaasuu halkaas ku dhacay, oo isla
meeshaasuu ku dhintay; oo in alla intii soo gaadhay meeshii
Casaaheel ku dhacay oo ku dhintay way wada istaageen. 24
Laakiinse Yoo'aab iyo Abiishay waxay eryadeen Abneer;
oo qorraxdiina way dhacday markii ay yimaadeen buurtii
Ammaah oo ku hor taal Giyax ee ku ag taal waddada cidlada
Gibecoon. 25 Markaasaa reer Benyaamiin dhammaantood
soo wada urureen oo Abneer soo daba galeen, oo waxay
noqdeen guuto keliya, markaasay buur isku dul taageen.
26 Dabadeedna Abneer wuxuu u dhawaaqay Yoo'aab,
oo ku yidhi, War seeftu miyey weligeed baabbi'inaysaa?
Ugudambaystase inay qadhaadh noqonayso sow ma ogid?
Haddaba ilaa goormay noqonaysaa markaad dadka kala
hadlayso inay ka hadhaan walaalahooda ay eryanayaan?
27 Markaasaa Yoo'aab wuxuu yidhi, Rabbiga noloshiisaan
ku dhaartaye, haddaadan hadlin, hubaal dadku subaxda
waa iska tegi lahaa oo ninnaba walaalkiis ma eryadeen.
28 Sidaas daraaddeed Yoo'aab buunkii buu afuufay, oo
dadkii oo dhammu way wada istaageen, oo mar dambe
reer binu Israa'iilna ma ayan eryan, kol kalena ma ay
diririn. 29 Oo Abneer iyo raggiisiina habeenkii oo dhan
ayay sii dhex guuraynayeen Caraabaah; wayna ka gudbeen
Webi Urdun, oo Bitroon oo dhanna way dhex mareen, oo
waxay yimaadeen Maxanayim. 30 Oo Yoo'aabna wuu ka
noqday eryadkii uu Abneer eryanayay; oo markuu dadkii
oo dhan soo urursaday, waxaa addoommadii Daa'uud ka
dhinnaaday sagaal iyo toban nin iyo Casaaheel. 31 Laakiinse
addoommadii Daa'uud wax bay reer Benyaamiin iyo raggii
Abneer ka laayeen, oo waxaa ka dhintay saddex boqol iyo
lixdan nin. 32 Markaasay Casaaheel qaadeen oo ku aaseen
qabrigii aabbihiis, oo ku yiil Beytlaxam. Oo Yoo'aab iyo
raggiisiina habeenkii oo dhan ayay guureeyeen oo waxaa
waagu ugu beryay Xebroon.

3 Haddaba waxaa jiray dagaal dheer oo dhex maray
reer Saa'uul iyo reer Daa'uud; oo Daa'uudna waa sii
xoog badnaanayay, laakiinse reer Saa'uul way sii xoog
yaraanayeen. 2 Oo Daa'uudna wiilal baa ugu dhashay
Xebroon. Curadkiisu wuxuu ahaa Amnoon, oo waxaa

dhashay Axiinocam tii reer Yesreceel. **3** Wiilkiisii labaadna
wuxuu ahaa Kile'aab, oo waxaa dhashay Abiigayil oo u
dhaxday Naabaal kii reer Karmel. Kan saddexaadna wuxuu
ahaa Absaaloom oo waxaa dhashay Macakaah oo ahayd
boqorkii Geshuur oo Talmay ahaa gabadhiisii. **4** Kan afraadna
wuxuu ahaa Adoniiyaah oo waxaa dhashay Xaggiid. Kan
shanaadna wuxuu ahaa Shefatyaah oo waxaa dhashay
Abiital. **5** Kan lixaadna wuxuu ahaa Yitrecaam, oo waxaa
dhashay Ceglaah oo Daa'uud u dhaxday. Intaasu waxay
Daa'uud ugu dhasheen Xebroon. **6** Intii ay reer Saa'uul
iyo reer Daa'uud dagaallamayeen ayaa Abneer aad ugu
xoogaystay reerkii Saa'uul. **7** Haddaba Saa'uul wuxuu lahaa
naag addoon ah oo magaceedana la odhan jiray Risfaah,
waxayna ahayd ina Ayah; oo Iishboshed wuxuu Abneer
ku yidhi, War maxaad ugu tagtay addoontii aabbahay? **8**
Markaasaa Abneer aad ugu cadhooday erayadii Iishboshed,
oo wuxuu yidhi, Anigu ma waxaan ahay madax eey oo
reer Yahuudah leeyihiin? Bal maanta raxmad baan tusayaa
reerkii aabbahaa Saa'uul, iyo walaalihiis, iyo saaxiibbadiis,
oo adigana kuuma aan gacangelin Daa'uud, oo weliba
maanta waxaad igu eedaynaysaa wax ku saabsan naagtan.
**9** Haddaba sidii Rabbigu ugu dhaartay Daa'uud, Ilaah saas
iyo si ka sii badanba anoo Abneer ah, ha igu sameeyo
haddaanan saas oo kale isaga ku samayn, **10** taasoo ah
inaan boqortooyada ka wareejiyo reer Saa'uul, iyo inaan
carshiga Daa'uud u qotomiyo reer binu Israa'iil iyo reer binu
Yahuudah, iyo tan iyo Daan iyo ilaa Bi'ir Shebac. **11** Oo isna
eray dambe wuu ugu jawaabi waayay Abneer, maxaa yeelay,
wuu ka cabsanayay. **12** Markaasaa Abneer wuxuu Daa'uud
u soo diray wargeeyayaal magiciisa ku hadlaya, oo leh, War
dhulka yaa leh? Oo wuxuu kaloo ku yidhi, Heshiis ila dhigo,
anna gacan baan ku siinayaa, inaan kuu soo wada jeediyo
reer binu Israa'iil oo dhan. **13** Markaasuu yidhi, Waa hagaag;
heshiis baan kula dhiganayaa, laakiinse wax baan kaa
doonayaa, taasuna waxaa weeyaan, markaad ii timaadid waa
inaadan i hor iman adoo marka hore Miikaal oo ah ina Saa'uul
i soo hor taaga mooyaane. **14** Oo Daa'uudna wargeeyayaal
buu u diray Iishboshed oo ahaa ina Saa'uul, isagoo leh, Ii
keen naagtaydii Miikaal, oo aan ku guursaday boqol buuryo
oo reer Falastiin. **15** Markaasaa Iishboshed rag u diray oo
iyadii ka soo kexeeyey ninkeedii, kaasoo ahaa Faltii'eel ina
Layish. **16** Markaasaa ninkeedii soo raacay iyadii, isagoo
ooyaya intuu socday oo dhan, oo wuxuu iyadii daba socday
tan iyo Baxuuriim. Markaasaa Abneer ku yidhi, War orod, oo
iska noqo. Kolkaasuu iska noqday. **17** Oo Abneerna wuxuu
la arrinsaday odayaashii reer binu Israa'iil, oo ku yidhi, Waa
hore waxaad doonayseen in Daa'uud boqor idiin noqdo. **18**
Haddaba haatan sidii yeela, waayo, Rabbigu Daa'uud buu
ka hadlay, oo yidhi, Addoonkayga Daa'uud gacantiisa ayaan
dadkayga reer binu Israa'iil kaga badbaadin doonaa gacanta
reer Falastiin iyo gacanta cadaawayaashooda oo dhanba.
**19** Oo Abneer wuxuu kaloo la hadlay reer Benyaamiin; oo
weliba Abneer wuxuu Daa'uud ugu yimid Xebroon si uu ugu
sheego waxa la wanaagsan reer binu Israa'iil oo dhan, iyo
reer Benyaamiin oo dhanba. **20** Saas aawadeed Abneer
wuxuu Daa'uud ugu yimid Xebroon, labaatan nin baana
la socday. Oo Daa'uudna diyaafad ayuu Abneer iyo raggii
la socdayba u sameeyey. **21** Markaasaa Abneer Daa'uud
ku yidhi, Anigu waan kacayaa, waanan tegayaa, oo reer
binu Israa'iil oo dhanna waan kuu soo wada ururin doonaa,
boqorow, sayidkaygiiyow, inay axdi kula dhigtaan oo adna
aad xukuntid in alla intii naftaadu doonayso. Markaasaa
Daa'uud Abneer iska diray; oo isna nabad buu ku tegey. **22**
Oo bal eeg, Daa'uud addoommadiisii iyo Yoo'aabba waxay
ka yimaadeen duulaan, iyagoo dhac badan wada, laakiinse
Abneer Daa'uud lama joogin Xebroon, waayo, wuu iska
diray, oo isna nabad buu ku tegey. **23** Oo markii Yoo'aab iyo
ciidankii la jiray oo dhammu ay yimaadeen waxaa Yoo'aab
loo sheegay, oo lagu yidhi, Waxaa boqorka u yimid Abneer
ina Neer, oo isna wuu iska diray, markaasuu nabad ku
tegey. **24** Markaasaa Yoo'aab boqorkii u yimid, oo ku yidhi,
Maxaad samaysay? Bal eeg, Abneer baa kuu yimid, maxaad
u dirtay oo uu u tegey? **25** Abneer oo ah ina Neer waad
garanaysaa inuu kuugu yimid inuu ku khiyaaneeyo, iyo inuu
ogaado bixiddaada iyo soo geliddaada, iyo weliba inuu sii
ogaado waxaad samaysid oo dhanba. **26** Yoo'aabna markuu
Daa'uud ka soo baxay ayuu rag ka daba diray Abneer,
oo waxay ka soo celiyeen ceelkii Siraah, laakiinse taas
Daa'uud ma ogayn. **27** Oo markuu Abneer ku soo noqday
Xebroon ayaa Yoo'aab gees ula baxay oo iridda la dhex
galay si uu ula faqo, markaasuu caloosha ka dooxay si uu u
dhinto, maxaa yeelay, dhiiggii walaalkiis Casaaheel ayuu
daadshay. **28** Dabadeedna markuu Daa'uud taas maqlay
ayuu yidhi, Aniga iyo boqortooyadayda midna eed kuma
lahayn Rabbiga hortiisa xagga dhiigga Abneer ina Neer.
**29** Yoo'aab madaxiisa ha saarnaado, iyo reerka aabbihiis,
oo reer Yoo'aabna yaan laga waayin mid cudur dheecaan
leh qaba, iyo mid baras qaba, iyo mid ul ku tukubaya,
iyo mid seef lagu dilo, ama mid cunto la'. **30** Sidaasay
Yoo'aab iyo walaalkiis Abiishay u dileen Abneer, maxaa
yeelay, wuxuu walaalkood Casaaheel ku dilay dagaalkii
Gibecoon. **31** Markaasaa Daa'uud wuxuu ku yidhi Yoo'aab
iyo dadkii isaga la jiray oo dhan, Dharkiinna jeexjeexa oo
dhar joonyad ah guntada, oo Abneer hortiisa ku baroorta. Oo

Boqor Daa'uudna wuxuu raacay naxashkii. 32 Oo Abneer
waxaa lagu aasay Xebroon, boqorkiina codkiisii kor buu
u qaaday, oo qabrigii Abneer ku dul ooyay; oo dadkii oo
dhammuna way wada ooyeen. 33 Oo boqorkiina wuxuu u
baroortay Abneer, oo yidhi, Miyey habboon tahay in Abneer
u dhinto sida nacas u dhinto oo kale? 34 Gacmahaagu ma
xidhnayn, cagahaaguna ma dabranayn, Sida nin ugu dhaco
dad dembi leh hortooda ayaad u dhacday. Markaasaa dadkii
oo dhammu mar kale u ooyay isagii. 35 Markaasay dadkii
oo dhammu yimaadeen oo damceen inay Daa'uud wax
cunsiiyaan intii ay maalinnimada ahayd; laakiinse Daa'uud
wuu dhaartay, oo yidhi, Ilaah taasoo kale ha igu sameeyo, iyo
weliba tu ka sii badan, haddaan kibis dhadhansho, iyo wax
kale toona, ilaa ay qorraxdu dhacdo. 36 Markaasaa dadkii oo
dhammu taas u fiirsadeen, wayna la wanaagsanayd, oo wax
alla wixii boqorku sameeyey ayaa la wanaagsanaa dadkii oo
dhan. 37 Sidaasay dadkii oo dhan iyo reer binu Israa'iil oo
dhammu maalintaas u garteen inuusan boqorku doonaynin
in Abneer oo ahaa ina Neer la dilo. 38 Oo boqorkii wuxuu
addoommadiisii ku yidhi, War miyeydnaan ogayn maanta
inuu reer binu Israa'iil ku dhex dhintay amiir iyo nin weyn? 39
Oo anigu maanta in kastoo lay boqray, waan taag yarahay;
oo nimankan ay Seruuyaah dhashay ayaa iga xoog badan.
Kii shar sameeya Rabbigu ha ugu abaalgudo sida sharkiisu
yahay.

**4** Oo Saa'uul wiilkiisii Iishboshed ahaa markuu maqlay
in Abneer Xebroon ku dhintay ayaa gacmihiisii taag
beeleen, oo reer binu Israa'iil oo dhammuna way nexeen. 2
Oo Saa'uul wiilkiisii Iishboshed ahaana wuxuu lahaa laba nin
oo askartiisa saraakiil u ahaa. Mid magiciisu wuxuu ahaa
Bacanaah, oo kan kale magiciisuna wuxuu ahaa Reekaab,
oo waxayna ahaayeen ilmo Rimmon kii reer Bi'irod, oo
waxayna ahaayeen reer Benyaamiin (waayo, Bi'irod waxaa
lagu tiriyey reer Benyaamiin, 3 oo reer Bi'irodna waxay
u carareen xagga Gitayim, oo halkaasay degganaayeen
ilaa maantadan). 4 Yoonaataan ina Saa'uul wuxuu lahaa
wiil curyaan ah. Oo isagu shan jir buu ahaa markii war ku
saabsan Saa'uul iyo Yoonaataan Yesreceel laga keenay, ee
ay naagtii isaga dhawraysay kor u qaadatay, oo carartay.
Oo intay ku degdegaysay inay cararto ayuu ka dhacay,
oo markaasuu curyaan noqday. Oo magiciisuna wuxuu
ahaa Mefiiboshed. 5 Oo Rimmonkii reer Bi'irod wiilashiisii
oo ahaa Reekaab iyo Bacanaah way tageen, oo wakhti
kulul ayay gurigii Iishboshed yimaadeen, isagoo hadhkii
nasanaya. 6 Oo gurigay soo galeen, sidii iyagoo sarreen
qaadanaya; markaasay caloosha ka dooxeen. Markaasaa
Reekaab iyo walaalkiis Bacanaah baxsadeen. 7 Markay
guriga soo galeen, isagoo sariirta ku jiifa oo qolka la seexdo
ku jira, ayay garaaceen oo dileen, oo madaxiina way ka
gooyeen oo la tageen, markaasay jidkii Caraabaah habeenkii
oo dhan sii guuraynayeen. 8 Oo Iishboshed madaxiisii
ayay Daa'uud ugu keeneen Xebroon, oo waxay boqorkii
ku yidhaahdeen, Bal eeg madaxii Iishboshed ee uu dhalay
Saa'uul kii cadowgaaga ahaa oo doonayay inuu nafta
kaa qaado; haddaba sayidkaygiiyow, boqorow, Rabbigu
maanta waa kaaga aar guday Saa'uul iyo farcankiisiiba. 9
Markaasaa Daa'uud ugu jawaabay Reekaab iyo walaalkiis
Bacanaah, oo ahaa ilma Rimmonkii reer Bi'irod, Waxaan
ku dhaartay nolosha Rabbigii naftayda ka badbaadshay
cidhiidhi oo dhan, 10 markii mid ii soo sheegay inuu Saa'uul
dhintay, isagoo u malaynaya inuu war wanaagsan ii sido,
waan qabtay oo Siiqlag baan ku dilay, taasuna waxay
ahayd abaalgudkii aan warkiisii ka siiyey. 11 Haddaba
idinkoo ah niman shar leh, markaad disheen qof xaq ah
oo sariirtii gurigiisa ku jiifa, miyaanan in ka sii badan
dhiiggiisii gacmihiinna weyddiinayn, oo miyaanan dhulka
idinka qaadayn? 12 Markaasaa Daa'uud amray raggiisii
dhallinyarada ahaa, wayna dileen iyagii, oo waxay ka jareen
gacmihii iyo cagihii, oo ka soo lalmiyeen balliga Xebroon ku
yaal agtiisa. Laakiinse Iishboshed madaxiisii intay qaadeen
ayay ku aaseen qabrigii Abneer oo Xebroon ku yiil.

**5** Markaasaa qabiilooyinkii reer binu Israa'iil oo dhammu
waxay Daa'uud ugu yimaadeen Xebroon, oo intay la
hadleen ayay ku yidhaahdeen, Annagu waxaannu nahay
laftaada iyo jidhkaaga. 2 Waagii hore oo Saa'uul boqorka noo
ahaa, adiguu ahaa kii reer binu Israa'iil dibadda u bixin jiray
oo gudaha soo gelin jiray; oo Rabbiguna wuxuu kugu yidhi,
Adigu waxaad quudin doontaa dadkayga reer binu Israa'iil,
oo amiir baanad u ahaan doontaa reer binu Israa'iil. 3 Sidaas
aawadeed odayaashii reer binu Israa'iil oo dhammu waxay
boqorkii ugu yimaadeen Xebroon; oo Boqor Daa'uudna
wuxuu iyagii axdi kula dhigtay Xebroon Rabbiga hortiisa, oo
iyana waxay Daa'uud u boqreen inuu ahaado boqor reer
binu Israa'iil u taliya. 4 Oo Daa'uudna soddon sannadood
buu jiray markuu bilaabay inuu boqor noqdo, oo wuxuuna
boqor ahaa afartan sannadood. 5 Oo reer Yahuudahna
wuxuu Xebroon ugu talinayay toddoba sannadood iyo lix
bilood, oo reer Israa'iil oo dhan iyo reer Yahuudahna wuxuu
Yeruusaalem ugu talinayay saddex iyo soddon sannadood. 6
Oo boqorkii iyo raggiisiiba waxay tageen Yeruusaalem, inay
ku duulaan reer Yebuus oo ahaa dadkii dalka degganaa,
kuwaasoo la hadlay Daa'uud oo ku yidhi, Adoo kuwa indhaha

la' iyo curyaannada qaada mooyaane halkan iman maysid,
waayo, waxay u maleeyeen inuusan Daa'uud halkaas iman
karin. 7 Habase yeeshee Daa'uud waa qabsaday qalcaddii
Siyoon, oo taasuna waa magaaladii Daa'uud. 8 Markaasaa
Daa'uud maalintaas wuxuu yidhi, Ku alla kii reer Yebuus
laayaa, ha tago meesha biyomareenka ah, oo ha ku laayo
curyaannada iyo indhoolayaasha oo neceb Daa'uud naftiisa.
Sidaas daraaddeed waxay leeyihiin, Indhoolayaasha iyo
curyaannadu yaanay guriga soo gelin. 9 Oo Daa'uudna
qalcaddii ayuu degay, wuxuuna u bixiyey magaaladii Daa'uud.
Oo Daa'uudna wuxuu dhisay hareeraheedii iyo tan iyo
Millo ilaa gudaha. 10 Oo Daa'uudna aad iyo aad buu u sii
xoogaystay; waayo, waxaa isaga la jiray Rabbiga ah Ilaaha
ciidammada. 11 Markaasaa Xiiraam oo ahaa boqorkii Turos
ayaa Daa'uud wargeeyayaal u soo diray, iyo geedo kedar la
yidhaahdo, iyo nijaarro iyo wastaadyo, oo iyana guri bay
Daa'uud u dhiseen. 12 Oo Daa'uudna wuxuu ogaaday in
Rabbigu isaga u taagay inuu ahaado boqor u taliya reer binu
Israa'iil, iyo inuu boqortooyadiisa u sarraysiiyey dadkiisa
reer binu Israa'iil aawadood. 13 Oo Daa'uudna weliba
Yeruusaalem ayuu ka guursaday addoommo iyo naago
kale markuu Xebroon ka yimid dabadeed, oo weliba waxaa
Daa'uud u dhashay wiilal iyo gabdho. 14 Oo kuwanuna
waa kuwii isaga Yeruusaalem ugu dhashay magacyadoodii:
Shammuuca, iyo Shoobaab, iyo Naataan, iyo Sulaymaan,
15 iyo Yibxaar, iyo Eliishuuca, iyo Nefeg, iyo Yaafiica, 16
iyo Eliishaamaac, iyo Elyaadaac, iyo Eliifeled. 17 Oo reer
Falastiinna markay maqleen in Daa'uud loo subkay inuu boqor
u ahaado reer binu Israa'iil ayay reer Falastiin oo dhammu u
soo baxeen inay Daa'uud doondoonaan; oo Daa'uudna taas
wuu maqlay, markaasuu dhufayskii hoos ugu dhaadhacay.
18 Haddaba reer Falastiin way yimaadeen, oo waxay ku
firdheen dooxadii Refaa'iim. 19 Markaasaa Daa'uud Rabbiga
wax weyddiiyey, oo yidhi, Miyaan reer Falastiin ku kacaa?
Miyaad ii soo gacangelinaysaa? Markaasaa Rabbigu wuxuu
Daa'uud ku yidhi, Haah, ku kac, waayo, hubaal reer Falastiin
waan kuu soo gacangelinayaa. 20 Markaasaa Daa'uud yimid
Bacal Feraasiim, oo halkaasaa Daa'uud iyagii ku laayay, oo
yidhi, Rabbigu cadaawayaashaydii ayuu hortayda degdeg
ugu qabtay, sida biyaha butaacayaa u degdegaan oo kale.
Sidaas daraaddeed meeshaas magaceedii wuxuu u bixiyey
Bacal Feraasiim. 21 Iyana halkaasay sanamyadoodii kaga
tageen, waxaana qaaday Daa'uud iyo raggiisii. 22 Haddana
reer Falastiin mar kalay soo kaceen oo dooxadii Refaa'iim ku
firdheen. 23 Oo Daa'uudna markuu Rabbiga wax weyddiiyey
ayaa Rabbigu ku yidhi, Waa inaadan ku kicin, laakiinse
xagga dambe ka mar oo waxaad ku weerartaa meel ka soo
hor jeedda geedaha bukaa la yidhaahdo. 24 Oo markaad
sanqadha askarta socodkeeda ka maqashid geedaha bukaa
dushooda, kolkaas waa inaad dhaqsataa, waayo, Rabbigu
waa kaaga hor baxay inuu ciidanka reer Falastiin laayo.
25 Oo Daa'uudna sidii buu yeelay sidii Rabbigu ku amray,
oo wuxuu reer Falastiin ku laynayay ilaa Gebac iyo tan iyo
Geser.

6 Markaasaa Daa'uud haddana soo ururiyey raggii reer
binu Israa'iil oo la doortay oo dhan, waxayna ahaayeen
soddon kun. 2 Dabadeedna Daa'uud baa kacay, oo la tegey
dadkii isaga la jiray ee ka yimid Bacale Yahuudah oo dhan,
inay xaggaas ka soo qaadaan sanduuqii Ilaah, kaasoo lagu
magacaabo Magaca, waxa weeye Magaca Rabbiga ciidanka
ee dhex fadhiya keruubiimta. 3 Oo sanduuqii Ilaah gaadhi
cusub bay saareen, iyagoo ka soo bixiyey gurigii Abiinaadaab
oo buurta ku yiil; markaasaa gaadhigii cusbaa waxaa waday
Abiinaadaab wiilashiisii oo ahaa Cuusaah iyo Axiyoo. 4 Oo
sidaasay uga soo bixiyeen gurigii Abiinaadaab, oo buurta ku
yiil, iyagoo wada sanduuqii Ilaah; oo Axiyoo ayaa sanduuqii
hor maray. 5 Daa'uud iyo reer binu Israa'iil oo dhammuna
Rabbiga hortiisay ku cayaareen iyagoo haysta cayn kasta oo
alaabta muusikada ah oo ah qori beroosh la yidhaahdo, oo
alaabtaasu waxay ahaayeen kataarado, iyo shareerado,
iyo dafaf, iyo shuguxshugux iyo suxuun laysku garaaco. 6
Oo markay yimaadeen meeshii hadhuudhka lagu tumi jiray
oo Naakoon ayaa Cuusaah gacanta ku fidiyey sanduuqii
Ilaah, wuuna qabtay; maxaa yeelay, dibidii sidday ayaa
turunturootay. 7 Markaasaa Rabbigu aad ugu cadhooday
Cuusaah; oo Ilaahna halkaasuu ku dilay qaladkiisii aawadiis,
oo sanduuqii Ilaah agtiisa ayuu ku dhintay. 8 Oo Daa'uudna
taas buu ka xumaaday, maxaa yeelay, Rabbigu degdeg
buu u qabtay Cuusaah, oo meeshaas magaceediina wuxuu
u bixiyey Feres Cuusaah, oo ilaa maantadanna waa la
yidhaahdaa. 9 Oo Daa'uudna Rabbiga wuu ka baqay
maalintaas, oo wuxuu isyidhi, Sanduuqa Rabbigu sidee
buu iigu imanayaa? 10 Sidaas daraaddeed Daa'uud wuu
diiday inuu wado sanduuqii Rabbiga oo uu geeyo magaaladii
Daa'uud; laakiinse Daa'uud sanduuqii buu gees ugu leexshay
gurigii Cobeed Edoom kii reer Gad. 11 Oo saddex bilood
ayaa sanduuqii Rabbigu gurigii Cobeed Edoom yiil; oo
Rabbiguna wuu barakeeyey Cobeed Edoom iyo reerkiisii oo
dhanba. 12 Markaasaa Daa'uud loo soo sheegay oo lagu
yidhi, Rabbigu waa barakeeyey Cobeed Edoom reerkiisii,
iyo wixii uu lahaa oo dhan, taasuna waa sanduuqa Ilaah
aawadiis. Markaasaa Daa'uud tegey oo sanduuqii Ilaah ka
soo qaaday gurigii Cobeed Edoom oo farax ku soo geliyey

magaaladii Daa'uud. 13 Oo markii kuwii sanduuqa Rabbiga
siday ay lix tallaabo socdeen wuxuu allabari u qalay dibi
iyo nef kale oo shilis. 14 Oo Daa'uudna Rabbiga hortiisuu
xooggiisii oo dhan ugu cayaaray, wuxuuna guntanaa eefod
dhar wanaagsan laga sameeyey. 15 Sidaasay Daa'uud iyo
reer binu Israa'iil oo dhammu u soo qaadeen sanduuqii
Rabbiga, iyagoo qaylinaya oo buunna ka dhawaajinaya.
16 Oo markuu sanduuqii Rabbigu soo galay magaaladii
Daa'uud ayaa Miikaal oo ahayd ina Saa'uul dariishadda wax
ka fiirisay, oo waxay aragtay Boqor Daa'uud oo boodboodaya
oo Rabbiga hortiisa ku cayaaraya; markaasay quudhsatay.
17 Sanduuqii Rabbigana gudahay soo geliyeen oo meeshiisii
bay dhigeen, taasoo ahayd teendhadii Daa'uud u dhisay
badhtankeeda; kolkaasaa Daa'uud Rabbiga hortiisa ku
bixiyey qurbaanno la gubo iyo qurbaanno nabaadiino. 18
Oo Daa'uudna markuu dhammeeyey qurbaankii la gubayay
iyo qurbaannadii nabaadiinada ee uu bixinayay ayuu dadkii
ugu duceeyey magicii Rabbiga ciidammada. 19 Markaasuu
wuxuu dadkii oo dhan, iyo xataa dadkii badnaa oo reer binu
Israa'iil oo dhan, rag iyo dumarba, mid kasta siiyey xabbad
kibis ah, iyo cad hilib ah, iyo fud sabiib ah. Markaasaa
dadkii oo dhan mid waluba gurigiisii tegey. 20 Markaasaa
Daa'uud u noqday inuu reerkiisii u duceeyo. Oo Miikaal
oo ahayd ina Saa'uul ayaa u soo baxday inay Daa'uud ka
hor timaado, oo waxay ku tidhi, Boqorka reer binu Israa'iil
qurux badnaa maanta, kaasoo maanta isku hor qaawiyey
gabdhihii addoommadiisa sida waxmatarayaasha midkood
isugu qaawiyo oo kale! 21 Markaasaa Daa'uud Miikaal
ku yidhi, Waxay ahayd Rabbiga hortiisa, kii iga doortay
aabbahaa iyo reerkiisii oo dhan, oo iga dhigay amiir u
taliya dadka Rabbiga, kuwaas oo ah reer binu Israa'iil; oo
sidaas daraaddeed ayaan Rabbiga hortiisa ugu cayaarayaa.
22 Oo weliba intaas waan ka sii liidanayaa, oo waan isla
xumaanayaa, laakiinse gabdhihii aad ka hadashay xaggooda
derejaan ka lahaan doonaa. 23 Oo Miikaal oo ahayd ina
Saa'uulna ilaa maalintii ay dhimatay ilmo ma dhalin.

**7** Oo waxay noqotay markii boqorkii gurigiisii degay oo
uu Rabbigu nasasho ka siiyey cadaawayaashiisii ku
wareegsanaa oo dhan, 2 in boqorkii Nebi Naataan ku yidhi,
Bal eeg haatan, anigu waxaan degganahay guri qori kedar
ah laga sameeyey, laakiinse sanduuqii Ilaah wuxuu dhex yaal
daahyo. 3 Markaasaa Naataan wuxuu boqorkii ku yidhi, Tag,
oo wax alla wixii qalbigaaga ku jira samee, waayo, Rabbiga
ayaa kula jira. 4 Oo isla habeenkaas Rabbiga eraygiisii baa
Naataan u yimid oo ku yidhi, 5 Tag, oo waxaad addoonkayga
Daa'uud ku tidhaahdaa, Rabbigu wuxuu ku leeyahay, War
guri aan dego ma ii dhisaysaa? 6 Waayo, guri ma degin ilaa
maalintii aan reer binu Israa'iil ka soo bixiyey dalkii Masar
iyo tan iyo maantadan, laakiinse waxaan ku dhex socday
teendho iyo taambuug. 7 Oo meel kasta oo aan kula socday
reer binu Israa'iil oo dhan, qabiilooyinka reer binu Israa'iil oo
aan ku amray inay quudiyaan dadkayga reer binu Israa'iil
ma midkood baan eray kula hadlay oo miyaan ku idhi, War
maxaad iigu dhisi weydeen guri kedar ah? 8 Haddaba
waxaad addoonkayga Daa'uud ku tidhaahdaa, Rabbiga
ciidammadu wuxuu leeyahay, Anaa kaa soo kexeeyey
xeradii idaha iyo idihii aad raacaysay, inaad ahaatid amiir u
taliya dadkayga reer binu Israa'iil, 9 waanan kula jiray meel
kastoo aad tagtayba, oo cadaawayaashaadii oo dhanna
hortaadaan ka baabbi'iyey. Oo waxaan kuu bixin doonaa
magac weyn, oo la mid ah magacyada kuwa waaweyn oo
dhulka jooga. 10 Oo dadkayga reer binu Israa'iilna meel baan
u dooran doonaa, oo waan ku beeri doonaa inay meeshooda
degganaadaan oo ayan mar dambe dhaqdhaqaaqin, ama
ayan ilmaha sharku mar dambe dhibin sidii markii hore, 11 iyo
tan iyo maalintii aan xaakinno ku amray inay dadkayga reer
binu Israa'iil u taliyaan. Oo adiga waan kaa nasin doonaa
cadaawayaashaada oo dhan. Oo weliba Rabbigu wuxuu
kuu sheegayaa inuu reer kuu yeeli doono. 12 Oo markii
cimrigaagu dhammaado, oo aad la seexato awowayaashaa,
farcankaaga kaa dambeeya oo kaa soo bixi doona ayaan
sara kicin doonaa, oo boqortooyadiisana waan dhisi doonaa.
13 Oo isna guri buu magacayga u dhisi doonaa, oo xoog baan
u yeeli doonaa carshiga boqortooyadiisa weligiis. 14 Oo anigu
aabbaan u ahaan doonaa, isna wiil buu ii ahaan doonaa, oo
hadduu dembi galona, waxaan ku edbin doonaa usha dadka
iyo garaacidda binu-aadmiga, 15 laakiinse naxariistaydu ka
dhammaan mayso isaga, sidii aan Saa'uul uga dhammeeyey
oo kale, kaasoo ahaa kii aan hortaa fogeeyey. 16 Oo
reerkaaga iyo boqortooyadaadaba waxaa laga dhigi doonaa
kuwo weligood hortaada ku raaga, oo carshigaaguna weligiis
wuu dhisnaan doonaa. 17 Haddaba siday erayadaas oo
dhan iyo tusniintaas oo dhammu ahaayeen ayaa Naataan
kula hadlay Daa'uud. 18 Markaasaa Boqor Daa'uud gudaha
galay oo Rabbiga hor fadhiistay, oo wuxuu yidhi, Sayidow,
Rabbow, bal yaan ahay? Reerkayguna waa maxay oo aad
halkan ii soo gaadhsiisay? 19 Oo weliba waxanu hortaada
wuu ku yaraa, Sayidow, Rabbow, laakiinse waxaad kaloo
ka sii hadashay reerkaygu wuxuu wakhti dheer noqon
doono, oo Sayidow, Rabbow, taasu ma caadada dadkaa? 20
Sayidow, Rabbow! Bal maxaan kaloo kugu odhan karaa?
Waayo, waad i garanaysaa anoo addoonkaaga ah, Rabbow
Ilaahow. 21 Eraygaaga aawadiis iyo qalbigaagu siduu yahay

ayaad waxyaalahan waaweyn oo dhan u samaysay, inaad i
ogeysiisid anoo addoonkaaga ah. 22 Haddaba, Rabbow
Ilaahow, waad weyn tahay, waayo, mid kula mid ahu ma jiro,
oo adiga mooyaane Ilaah kale ma jiro, siday ahaayeen kulli
wixii aannu dhegahayaga ku maqalnay oo dhammu. 23 Bal
quruuntee baa dunida joogta oo la mid ah dadkaaga reer
binu Israa'iil, kuwaasoo adiga qudhaadu aad soo furatay
inay dad kuu ahaadaan, iyo inaad magac isu yeesho, oo
aad waxyaalo waaweyn isu samayso, iyo inaad dalkaaga
aawadiis waxyaalo cabsi leh ugu samayso dadkaaga hortiisa,
kuwaasoo aad ka soo furatay dalkii Masar, iyo quruumaha iyo
ilaahyadooda? 24 Oo waxaad dhisatay dadkaagii reer binu
Israa'iil inay dad kuu ahaadaan weligood, oo Ilaahood baad
noqotay, Rabbiyow. 25 Haddaba, Rabbow Ilaahow, eraygii
aad ku hadashay oo igu saabsanaa anoo addoonkaaga
ah oo ku saabsanaa reerkayga weligaa adkee oo sidaad
ugu hadashay yeel. 26 Oo magacaaguna ha weynaado
weligiis, hana la yidhaahdo, Rabbiga ciidammadu waa Ilaaha
u taliya reer binu Israa'iil, oo anoo addoonkaaga Daa'uud ah
reerkayguna wuu ku dhismi doonaa hortaada. 27 Waayo,
Rabbiga ciidammadow, Ilaaha reer binu Israa'iilow, anoo
addoonkaaga ah wax baad ii muujisay, oo waxaad igu tidhi,
Reer baan kuu dhisi doonaa, sidaas daraaddeed waan
ku dhiirranahay inaan baryadan ku baryo. 28 Haddaba,
Sayidow, Rabbow, waxaad tahay Ilaah, oo erayadaaduna
waa run, oo waxan wanaagsanna waad ii ballanqaadday
anoo addoonkaaga ah. 29 Haddaba, Sayidow, Rabbow, waan
ku baryayaaye, anoo addoonkaaga ah, barakee reerkayga
inuu weligiisba hortaada ku sii raago, waayo, adigaa taas ku
hadlay, oo reerkayguna weligiis ha barakaysnaado.

**8** Oo taas dabadeed ayaa Daa'uud reer Falastiin laayay,
oo jebiyey, oo Daa'uudna wuxuu gacantii reer Falastiin
ka qaaday magaalada la yidhaahdo Meteg Ammaah. 2 Oo
wuxuu kaloo laayay reer Moo'aab, oo intuu dhulka jiifiyey
ayuu xadhig ku qiyaasay, oo markaasuu laba xadhig wuxuu
u qiyaasay in la dilo, xadhig buuxana wuu la hadhay iyagoo
nool. Oo reer Moo'aabna addoommay Daa'uud u noqdeen,
oo baad bay u keeneen. 3 Daa'uudna wuxuu kaloo dilay
boqorkii Soobaah, oo ahaa Hadadceser ina Rexob, intuu
ku socday inuu dowladnimadiisii ku soo ceshado Webiga
agtiisa. 4 Oo Daa'uud wuxuu isagii ka qabsaday kun iyo
toddoba boqol oo fardooley ah, iyo labaatan kun oo nin oo
lug ah; oo Daa'uudna wuxuu boqno jaray fardihii gaadhiyada
waday oo dhan, laakiinse iyagii boqol gaadhifaras buu
uga reebay. 5 Oo reer Suuriyihii Dimishaqna markay u
yimaadeen inay u hiiliyaan boqorkii Soobaah oo ahaa
Hadadceser, Daa'uud wuxuu reer Suuriya ka laayay laba iyo
labaatan kun oo nin. 6 Daa'uudna wuxuu reer Dimishaq oo
Suuriya jooga dhex dhigay rugo askareed, oo reer Suuriyana
Daa'uud bay addoommo u noqdeen oo baad u keeneen. Oo
Rabbiguna Daa'uud guul buu siiyey meel kastoo uu tegeyba.
7 Markaasaa Daa'uud soo qaaday gaashaammadii dahabka
ahaa oo ay wateen addoommadii Hadadceser, wuxuuna
keenay Yeruusaalem. 8 Oo magaalooyinkii Hadadceser oo
ahaa Betax, iyo Beerootay Boqor Daa'uud wuxuu ka soo
qaaday naxaas aad iyo aad u badan. 9 Oo Tocii oo ahaa
boqorkii Xamaad markuu maqlay in Daa'uud laayay ciidankii
Hadadceser oo dhan, 10 ayaa Tocii wiilkiisii Yooraam u soo
diray inuu soo salaamo Boqor Daa'uud oo uu u soo duceeyo,
maxaa yeelay, wuxuu la diriray oo dilay Hadadceser; waayo,
Hadadceser wuxuu la diriri jiray Tocii. Oo Yooraamna wuxuu
keenay weelal lacag ah, iyo weelal dahab ah iyo weelal
naxaas ah, 11 oo kuwaasna Boqor Daa'uud wuxuu quduus
uga dhigay Rabbiga, oo wuxuu ku daray lacagtii iyo dahabkii
uu quduuska ka dhigay oo uu ka soo dhacay quruumihii
uu jebiyey oo dhan; 12 kuwaas oo ahaa reer Suuriya, iyo
reer Moo'aab, iyo reer Cammoon, iyo reer Falastiin, iyo
reer Camaaleq, iyo dhicii uu boqorkii Soobaah oo ahaa
Hadadceser ina Rexob ka helay. 13 Oo Daa'uudna magac
buu isu yeelay markuu ka soo noqday layntii uu reer Suuriya
Dooxadii Cusbada kaga laayay siddeed iyo tobanka kun oo
nin. 14 Oo wuxuu Edom dhex dhigay rugo askareed; oo
Edom oo dhanna wuxuu dhex dhigay rugo askareed, oo reer
Edom oo dhammuna Daa'uud bay addoommo u noqdeen. Oo
Rabbiguna Daa'uud guul buu siiyey meel kastoo uu tegeyba.
15 Oo Daa'uudna reer binu Israa'iil oo dhan buu u taliyey; oo
Daa'uud wuxuu dadkiisii oo dhan ugu gar qaybshay xukun
iyo caddaalad. 16 Oo waxaa ciidanka u sarrayn jiray Yoo'aab
oo ay Seruuyaah dhashay; oo taariikhdana waxaa qori jiray
Yehooshaafaad ina Axiiluud, 17 oo wadaaddona waxaa
ahaa Saadooq ina Axiituub, iyo Axiimeleg ina Aabyaataar,
oo Seraayaahna wuxuu ahaa karraani; 18 Benaayaah ina
Yehooyaadaacna wuxuu u taliyey reer Kereetiim iyo reer
Feleetii, oo Daa'uud wiilashiisuna waxay ahaayeen wasiiro.

**9** Markaasaa Daa'uud yidhi, War reerkii Saa'uul wax
ka hadhay ma jiraan, aan Yoonaataan aawadiis ugu
roonaadee? 2 Reerkii Saa'uulna waxaa halkaas ka joogay
addoon magiciisa la yidhaahdo Siibaa, oo isagii bay Daa'uud
ugu yeedheen. Boqorkiina wuxuu ku yidhi, Ma Siibaad baad
tahay? Oo isna ku yidhi, Haah, waan ahay anoo addoonkaaga
ah. 3 Markaasaa boqorkii yidhi, Miyaan reerkii Saa'uul wax
ka hadhin aan Ilaah aawadiis ugu roonaadee? Siibaana

wuxuu boqorkii ku yidhi, Waxaa ka hadhay wiil Yoonaataan
dhalay, oo curyaan ah. 4 Kolkaasaa boqorkii isagii ku yidhi,
Xaggee buu joogaa? Siibaana wuxuu boqorkii ku yidhi,
Wuxuu joogaa guriga Maakiir oo ah ina Cammii'eel ee
deggan Loo Debaar. 5 Markaasaa Boqor Daa'uud u cid diray,
oo ka soo kexeeyey gurigii Maakiir oo ahaa ina Cammii'eel,
oo ku yiil Loo Debaar. 6 Dabadeedna waxaa Daa'uud u
yimid Mefiiboshed, oo ahaa ina Yoonaataan, ina Saa'uul, oo
intuu wejiga u dhacay ayuu u sujuuday. Kolkaasaa Daa'uud
yidhi, War Mefiiboshedow. Oo isna wuxuu ugu jawaabay,
Way kan anoo addoonkaaga ah. 7 Markaasaa Daa'uud
isagii ku yidhi, Ha cabsan, waayo, xaqiiqa waxaan kuugu
roonaan doonaa aabbahaa Yoonaataan aawadiis, oo weliba
waxaan kuu celin doonaa dhulkii awowgaa Saa'uul oo dhan;
oo miiskaygana had iyo goor wax baad ka cuni doontaa. 8
Oo isna intuu u sujuuday ayuu ku yidhi, Bal maxaad igu
aragtay anigoo u eg eey dhintay, anoo addoonkaaga ahna
maxaan ahay? 9 Markaasaa boqorkii wuxuu u yeedhay
Siibaa, oo ahaa Saa'uul midiidinkiisii, oo wuxuu ku yidhi,
Kulli wixii Saa'uul lahaa iyo wax alla wixii reerkiisu lahaa oo
dhan waxaan siiyey wiilkii sayidkaaga. 10 Haddaba waa
inaad dhulka u fashaan isaga, adiga iyo wiilashaada iyo
addoommadaaduba, oo midhahana waa inaad gudaha soo
gelisaa si uu sayidkaaga wiilkiisu u helo wax uu cuno,
laakiinse sayidkaaga wiilkiisa Mefiiboshed ahu mar kasta
wax buu ka cuni doonaa miiskayga. Haddaba Siibaa wuxuu
lahaa shan iyo toban wiil iyo labaatan addoon. 11 Markaasaa
Siibaa wuxuu boqorkii ku yidhi, Wax alla wixii adoo ah
boqorka sayidkayga aad igu amarto anoo addoonkaaga ah,
ayaan u yeelayaa. Oo boqorkiina wuxuu yidhi, Mefiiboshed
wuxuu wax ka cuni doonaa miiskayga sidii mid boqorka
wiilashiisa ka mid ah. 12 Oo Mefiiboshedna wuxuu lahaa wiil
yar, oo magiciisuna wuxuu ahaa Miikaa. Intii Siibaa gurigiisa
joogtay oo dhammu addoommay Mefiiboshed u ahaayeen.
13 Mefiiboshedna wuxuu degganaa Yeruusaalem, waayo,
wuxuu had iyo goor wax ka cuni jiray miiskii boqorka, oo
labada cagoodna curyaan buu ka ahaa.

**10** Taas dabadeedna boqorkii reer Cammoon ayaa dhintay,
meeshiisiina waxaa boqor ka noqday wiilkiisii Xaanuun
ahaa. 2 Markaasaa Daa'uud yidhi, Anigu Xaanuun ina
Naaxaash, waxaan ugu roonaan doonaa sidii aabbihiis
iigu roonaaday oo kale. Sidaas daraaddeed Daa'uud
wuxuu u diray addoommadiisii inay ka soo tacsiyeeyaan
aabbihiis. Oo addoommadii Daa'uudna waxay yimaadeen
dalkii reer Cammoon. 3 Laakiinse amiirradii reer Cammoon
waxay ku yidhaahdeen sayidkoodii Xaanuun, Ma waxaad
u malaynaysaa in Daa'uud aabbahaa cisaynayo oo uu
sidaas daraaddeed kuugu soo diray kuwa tacsiyada wada?
Daa'uud sow uma soo dirin addoommadiisii inay magaalada
baadhaan, oo ay soo basaasaan, oo ay dabadeedna
afgembiyaan? 4 Sidaas daraaddeed Xaanuun wuxuu
qabsaday Daa'uud addoommadiisii, oo intuu gadhkoodii badh
ka xiiray ayuu dharkoodiina dhexda ka kala gooyay xataa ilaa
dabada, markaasuu iska eryay. 5 Oo taas markii Daa'uud loo
soo sheegay wuxuu iyagii u diray dad ka hor taga, waayo,
nimankii aad bay u ceeboobeen. Boqorkiina wuxuu iyagii
ku yidhi, Yerixoo iska jooga ilaa gadhku idiin soo baxo,
dabadeedna soo noqda. 6 Oo reer Cammoonna markay
ogaadeen inay Daa'uud isnacsiiyeen ayay u cid direen oo
ka soo kiraysteen reer Suuriyihii Beytrexob degganaa, iyo
reer Suuriyihii Soobaah degganaa labaatan kun oo nin
oo lug ah, iyo boqorkii Macakaah oo isna wata kun nin,
iyo raggii reer Toob oo iyana ahaa laba iyo toban kun
oo nin. 7 Oo Daa'uudna markuu taas maqlay ayuu diray
Yoo'aab, iyo ciidankii raggii xoogga lahaa oo dhan. 8 Oo reer
Cammoonna way soo baxeen, oo waxay dagaal isugu soo
diyaariyeen iridda horteeda; oo reer Suuriyihii Soobaah ka
yimid, iyo kuwii Rexob ka yimid, iyo raggii reer Toob iyo reer
Macakaahna, duurkay keli ahaantood joogeen. 9 Haddaba
Yoo'aab markuu arkay in dagaal looga soo kacshay hore
iyo dibba ayuu raggii reer binu Israa'iil ka xushay kuwii
xuladka ahaa oo dhan, oo wuxuu u soo diyaariyey inay
reer Suuriya la dagaallamaan. 10 Oo dadkii intiisii kalena
wuxuu u dhiibay walaalkiis Abiishay, oo isna wuxuu u soo
diyaariyey inay reer Cammoon la dagaallamaan. 11 Oo
wuxuu yidhi, Haddii reer Suuriya iga xoog bataan, waa
inaad i soo caawisaa, laakiinse haddii reer Cammoon kaa
xoog bataan, markaasaan kuu iman doonaa oo waan ku
soo caawin doonaa. 12 Haddaba si fiican u dhiirranow,
oo aynu rag u ahaanno dadkeenna, iyo magaalooyinka
Ilaaheen aawadood; oo Rabbiguna ha sameeyo wixii la
wanaagsan. 13 Sidaas daraaddeed Yoo'aab iyo dadkii la
jirayba waxay ugu soo dhowaadeen inay la dagaallamaan
reer Suuriya, oo iyana markaasay hortiisa ka carareen.
14 Oo reer Cammoonna markay arkeen in reer Suuriya
carareen, ayay Abiishay iyana hortiisa saasoo kale uga
carareen, oo waxay galeen magaaladii. Markaasaa Yoo'aab
ka soo noqday reer Cammoon, oo Yeruusaalem yimid. 15
Oo reer Suuriyana markay arkeen in iyaga looga adkaaday
reer binu Israa'iil hortooda ayay dhammaantood isa soo
wada urursadeen. 16 Markaasaa Hadarceser u cid diray oo
soo wada kexeeyey reer Suuriyihii Webiga ka shisheeyey;
oo waxay yimaadeen Xeelaam, iyagoo uu madax u yahay
Shoobag oo ahaa sirkaalkii ciidanka Hadarceser. 17 Taas

waxaa loo soo sheegay Daa'uud, kolkaasuu reer binu Israa'iil
oo dhan soo wada ururiyey, oo intuu ka soo gudbay Webi
Urdun ayuu Xeelaam yimid. Markaasaa reer Suuriya isugu
soo diyaariyeen inay Daa'uud la dagaallamaan, wayna la
dirireen. 18 Oo reer Suuriyana way ka carareen reer binu
Israa'iil. Daa'uudna wuxuu reer Suuriya ka laayay toddoba
boqol oo gaadhifaras raggoodii iyo afartan kun oo fardooley
ah, oo wuxuu dilay Shoobag oo ahaa sirkaalkii ciidankooda,
halkaasuuna ku dhintay. 19 Oo markii boqorradii Hadarceser
addoommada u ahaa oo dhammu ay arkeen in iyaga reer
binu Israa'iil hortooda looga adkaaday ayay la nabdeen reer
binu Israa'iil, wayna u adeegeen. Oo saas aawadeed reer
Suuriya way ka cabsadeen inay mar dambe reer Cammoon
caawiyaan.

**11** Oo isla xilligii sannaddii dambe, markay boqorradu
dagaalka u soo bixi jireen ayaa Daa'uud Yoo'aab diray
isagoo wata addoommadiisii, iyo reer binu Israa'iil oo dhan,
oo waxay baabbi'iyeen reer Cammoon, oo Rabbaahna way
hareereeyeen, laakiinse Daa'uud baa Yeruusaalem iska
joogay. 2 Oo makhribkii ayaa Daa'uud ka kacay sariirtiisii,
oo wuxuu dul socday gurigii boqorka saqafkiisa, oo wuxuu
saqafka ka arkay naag maydhanaysa, naagtuna aragga aad
bay u qurux badnayd. 3 Markaasaa Daa'uud cid naagtii soo
haybsata diray. Oo waxaa la yidhi, War sow tanu ma aha
Batshebac ina Eliicaam, oo uu Uuriyaah kii reer Xeed qabo?
4 Markaasaa Daa'uud wargeeyayaal u diray, wuuna soo
kaxaystay; markaasay u soo gashay, wuuna la seexday,
(waayo, waxay iska daahirisay nijaasteedii); dabadeedna
gurigeedii bay ku noqotay. 5 Oo naagtiina way uuraysatay;
markaasay Daa'uud u soo cid dirtay oo u sheegtay, waxayna
ku tidhi, Uur baan yeeshay. 6 Daa'uudna cid buu u diray
Yoo'aab, oo ku yidhi, Ii soo dir Uuriyaah kii reer Xeed.
Markaasaa Yoo'aab Uuriyaah u soo diray Daa'uud. 7 Oo
markii Uuriyaah u yimid ayaa Daa'uud weyddiiyey Yoo'aab
siduu ahaa, iyo sidii dadku u nabdoonaa, iyo dagaalkii
sida loogu guulaystay. 8 Daa'uudna wuxuu Uuriyaah ku
yidhi, Bal orod gurigaaga tag oo cagomaydho. Markaasaa
Uuriyaah gurigii boqorka ka baxay oo waxaana lala daba
galay cunto ka tagtay xagga boqorka. 9 Laakiinse Uuriyaah
guriga boqorka iriddiisa ayuu la seexday addoommadii
sayidkiisa oo dhan, oo gurigiisiina ma uu tegin. 10 Daa'uudna
waa loo soo sheegay oo lagu yidhi, Uuriyaah gurigiisii
ma tegin. Markaasaa Daa'uud wuxuu Uuriyaah ku yidhi,
War miyaadan sodcaal ka iman? Maxaadse gurigaaga
u tegi weyday? 11 Markaasaa Uuriyaah wuxuu Daa'uud
ku yidhi, Sanduuqa Ilaah, iyo reer binu Israa'iil, iyo reer
Yahuudahba waxay ku jiraan waabab; oo sayidkaygii Yoo'aab
iyo addoommadii sayidkayguba waxay ku hoydaan berrin
bannaan; haddaba miyaan u galaa gurigayga inaan wax
cuno, oo wax cabbo, oo naagtayda la seexdo? Haddaba
waxaan ku dhaartay noloshaada iyo naftaada inaanan waxan
samaynayn. 12 Markaasaa Daa'uud Uuriyaah ku yidhi,
Haddaba bal maantana iska joog oo berrina waan ku dirayaa.
Saas aawadeed Uuriyaah maalintaas iyo maalintii dambeba
Yeruusaalem buu joogay. 13 Markii Daa'uud u yeedhay
ayuu hortiisa wax ku cunay oo wax ku cabbay; markaasuu
sakhraamiyey, oo fiidkii buu tegey inuu sariirtiisii jiifsado
isagoo la socda addoommadii sayidkiisa, laakiinse gurigiisii
ma uu tegin. 14 Oo subaxdii dambe Daa'uud warqad buu
Yoo'aab u qoray, wuxuuna ugu sii dhiibay Uuriyaah. 15 Oo
wuxuu warqaddiisii ku qoray oo yidhi, Uuriyaah waxaad ugu
hor marisaan dagaalka ugu kulul, oo idinkuna dib uga noqda,
si loo dilo, uuna u dhinto. 16 Oo markuu Yoo'aab magaaladii
arkay ayuu Uuriyaah ku hagaajiyey meeshii uu ku ogaa inay
nimankii xoogga badnaa joogaan. 17 Oo raggii magaaladuna
way soo baxeen, oo Yoo'aab la dirireen, oo dadkiina qaar baa
ka dhintay, kuwaas oo ahaa addoommadii Daa'uud; Uuriyaah
kii reer Xeedna wuu dhintay. 18 Markaasaa Yoo'aab Daa'uud
cid u diray, oo wixii dagaalkii ku saabsanaa oo dhan ayuu
uga warramay, 19 oo kii farriinta wadayna wuxuu ku amray oo
ku yidhi, Markaad boqorka uga warrantid waxa dagaalka ku
saabsan oo dhan, 20 markaas hadduu boqorku cadhoodo, oo
kugu yidhaahdo, War maxaad magaalada ugu dhowaateen
inaad la dirirtaan? Miyeydaan ogayn inay derbiga idinka
soo tooganayaan? 21 Bal yaa dilay Abiimeleg oo ahaa
ina Yerubbeshed? Sow naagu dhagax wax lagu shiido
derbi kagama soo tuurin oo sow kuma uu dhiman Tebes?
Haddaba maxaad idinku derbiga ugu dhowaateen? Markaas
waxaad ku tidhaahdaa, Addoonkaagii Uuriyaah ahaa ee reer
Xeed isna waa dhintay. 22 Haddaba wargeeyihii waa tegey,
Daa'uudna wuu u yimid oo u sheegay wixii Yoo'aab u soo
diray oo dhan. 23 Oo wargeeyihii wuxuu Daa'uud ku yidhi,
Nimankii way naga xoog badnaadeen, markaasay dibadda
noogu soo baxeen, oo annana waxaannu eryannay iyagii ilaa
ay iriddii magaalada galeen. 24 Markaasay kuwii wax toogan
jiray addoommadaadii derbiga ka soo toogteen, oo boqorow,
addoommadaadiina qaar baa dhintay, oo addoonkaagii
Uuriyaah ahaa ee reer Xeed isna wuu dhintay. 25 Markaasaa
Daa'uud wuxuu wargeeyihii ku yidhi, Waxaad Yoo'aab ku
tidhaahdaa, Waxanu yay kula xumaan, waayo, seeftu mar
mid bay baabbi'isaa, marna midka kale, haddaba magaalada
dagaalka aad ugu sii adkee, oo afgembi; oo adna isaga
dhiirrigeli. 26 Oo Uuriyaah bilcaantiisiina markay maqashay
in ninkeedii Uuriyaah dhintay, way u barooratay ninkeedii.

27 Oo markii baroortii dhammaatay ayaa Daa'uud u soo
cid diray iyadii oo gurigiisii soo gashaday, oo iyana waxay
noqotay naagtiisii, wiilna way u dhashay. Laakiinse wixii
Daa'uud sameeyey ayaa Rabbigu ka xumaaday.

12 Dabadeedna Rabbigu wuxuu Daa'uud u soo diray
Naataan. Isna waa u yimid oo ku yidhi, Waxaa jiray laba
nin oo isku magaalo degganaa; midkood wuxuu ahaa taajir,
midka kalena miskiin. 2 Ninkii taajirka ahaa wuxuu lahaa
ido iyo lo' aad u badan, 3 laakiinse ninkii miskiinka ahaa
waxba ma lahayn, nayl yar mooyaane, taasoo uu mar hore
soo iibsaday oo uu korsaday; waxayna la kortay isagii iyo
carruurtiisii, oo wax bay ka cuntay cuntadiisii, oo koobkiisay
wax kula cabtay, oo laabtiisay ku jiifsatay, waxayna u ahayd
sidii gabadhiisii oo kale. 4 Waxaa ninkii taajirka ahaa u
yimid nin socoto ah, markaasuu ka lexejeclaystay idihiisii
iyo lo'diisii inuu uga loogo ninkii socotada ahaa ee u yimid,
laakiinse wuxuu soo qabtay nayshii ninka miskiinka ahaa,
wuuna u qalay ninkii u yimid. 5 Markaasaa Daa'uud aad
ugu cadhooday ninkii; oo wuxuu Naataan ku yidhi, Rabbiga
noloshiisaan ku dhaartay, ninkii waxakan sameeyey wuxuu
istaahilaa dhimasho, 6 oo nayshiina waa inuu afar jibbaar
u gudaa, maxaa yeelay, waxan buu sameeyey wuuna
naxariisan waayay. 7 Kolkaasaa Naataan wuxuu Daa'uud
ku yidhi, Ninkaasu waa adiga. Rabbiga ah Ilaaha reer binu
Israa'iil wuxuu leeyahay, Waxaan kuu subkay inaad ahaatid
boqor reer binu Israa'iil u taliya, gacantii Saa'uulna waan
kaa samatabbixiyey, 8 gurigii sayidkaagana waan ku siiyey,
naagihii sayidkaagana laabtaadaan ku jiifiyey; dalkii Israa'iil
iyo dalkii Yahuudahna waan ku siiyey; oo haddii intaasu kugu
yaraydna waxaan kuugu dari lahaa waxyaalo kaloo ka sii
badan. 9 Haddaba erayga Rabbiga maxaad u quudhsatay, oo
aad u samaysay waxa hortiisa ku xun? Seef baad ku dishay
Uuriyaah kii reer Xeed, oo naagtiisiina waad u kaxaysatay
inay naag kuu noqoto, oo isagiina waxaad ku dishay seeftii
reer Cammoon. 10 Sidaas daraaddeed seeftu reerkaaga ka
tegi mayso; maxaa yeelay, waad i quudhsatay, oo waxaad
kaxaysatay naagtii Uuriyaah kii reer Xeed inay naag kuu
noqoto. 11 Oo Rabbigu wuxuu leeyahay, Bal ogow, shar
baan gurigaaga kaaga kicin doonaa, oo adoo u jeeda ayaan
naagahaaga kaa kaxaysan doonaa, oo waxaan siin doonaa
deriskaaga, oo isna intay qorraxdanu soo jeeddo ayuu
naagahaaga la seexan doonaa. 12 Waayo, waxan qarsoodi
baad u samaysay, laakiinse anigu bayaan baan ugu hor
samaynayaa reer binu Israa'iil oo dhan iyo qorraxdaba. 13
Markaasaa Daa'uud wuxuu Naataan ku yidhi, Anigu Rabbiga
waan ku dembaabay. Oo Naataanna wuxuu Daa'uud ku
yidhi, Rabbigu dembigaagii wuu kaa fogeeyey; dhimanna
maysid. 14 Habase yeeshee waxaas aad samaysay aawadiis
ayaad meel siisay cadaawayaashii Rabbiga inay caytamaan,
taas aawadeed wiilka kuu dhashay hubaal wuu dhiman
doonaa. 15 Markaasaa Naataan gurigiisii tegey. Markaasaa
Rabbigu wax ku riday wiilkii naagta Uuriyaah Daa'uud
u dhashay, aad buuna u bukay. 16 Sidaas daraaddeed
Daa'uud ayaa wiilkiisii Ilaah u baryay, kolkaasaa Daa'uud
soomay, oo intuu gudaha galay ayuu habeenkii oo dhan
dhulka jiifay. 17 Markaasaa waxaa soo kacay odayaashii
reerkiisa, oo intay agtiisa soo istaageen ayay damceen
inay dhulka ka kiciyaan, laakiinse wuu diiday, oo waxbana
lama uu cunin. 18 Oo maalintii toddobaad ayaa yarkii
dhintay. Oo Daa'uud addoommadiisiina way ka cabsadeen
inay Daa'uud u sheegaan in yarkii dhintay, waayo, waxay
isyidhaahdeen, War intii yarku weli noolaa ayaynu isaga
la hadalnay, oo isna codkeennii ma uu maqlin; haddaba
haddaynu u sheegno in yarkii dhintay, intee in ka badan buu
isdhibi doonaa? 19 Laakiinse Daa'uud markuu arkay inay
addoommadiisii faqayaan ayuu ogaaday inuu yarkii dhintay;
kolkaasaa Daa'uud addoommadiisii ku yidhi, War yarkii ma
dhintay? Iyana waxay ku yidhaahdeen, Haah, wuu dhintay.
20 Kolkaasaa Daa'uud dhulkii ka kacay, oo maydhay, oo
intuu subkaday ayuu dharkiisii beddeshay; wuxuuna galay
gurigii Rabbiga, wuuna caabuday; oo dabadeedna gurigiisii
buu yimid, oo intuu cunto weyddiistay ayaa wax la soo
hor dhigay, wuuna cunay. 21 Markaasaa addoommadiisii
waxay ku yidhaahdeen, War waxan aad samaysay waa
maxay? Wiilku intuu noolaa ayaad soontay, oo u ooyday
aawadiis; laakiinse yarkii markuu dhintay, waad kacday,
wax baanad cuntay. 22 Markaasuu ku yidhi, Intii yarku
noolaa ayaan soomay oo ooyay, waayo, waxaan is-idhi,
Bal yaa og in Rabbigu ii roonaan doono iyo in kale si uu
yarku iigu sii noolaado? 23 Laakiinse haatan wuu dhintay,
haddaba bal maxaan u soomaa? Miyaan isagii soo celin
karaa? Anigaa u tegi doona, laakiinse isagu iima soo noqon
doono. 24 Markaasaa Daa'uud qalbi qabowjiiyey naagtiisii
Batshebac, oo intuu u tegey ayuu la seexday, markaasay
wiil u dhashay, oo wuxuu magiciisii u bixiyey Sulaymaan.
Kolkaasaa Rabbigu isagii jeclaaday, 25 oo wuxuu u diray
Nebi Naataan, magiciisiina wuxuu u bixiyey Yediidyaah,
Rabbiga aawadiis. 26 Markaasaa Yoo'aab la diriray Rabbaah
oo ahayd magaaladii reer Cammoon, wuuna qabsaday
magaaladii reer boqor. 27 Yoo'aabna wuxuu Daa'uud u diray
wargeeyayaal, oo ku yidhi, Waxaan la diriray Rabbaah,
waanan qabsaday magaaladii biyaha. 28 Haddaba dadka
intiisa kale soo ururso, oo magaalada horteeda deg, oo

qabso, waayo, waaba intaasoo intaan magaalada qabsado,
laygu magacaabaaye. 29 Markaasaa Daa'uud dadkii oo
dhan soo urursaday, wuxuuna tegey ilaa Rabbaah, wuuna la
diriray, oo qabsaday. 30 Boqorkoodii madaxiisii ayuu taajkii
ka qaaday, oo miisaankiisuna wuxuu ahaa talanti dahab
ah, dhagxan qaali ahna wuu lahaa; markaasaa Daa'uud
madaxa loo saaray. Oo wuxuu dibadda u soo bixiyey dhacii
magaalada oo aad iyo aad u badnaa. 31 Dibadduu u soo
bixiyey dadkii magaalada ku jiray, oo wuxuu hoos dhigay
miinshaaro, iyo biro wax lagu qodo, iyo faasas biro ah,
oo wuxuu ka dhex dusiyey meesha lebenka lagu dubo;
saasuuna u wada galay magaalooyinkii reer Cammoon
oo dhan. Markaasaa Daa'uud iyo dadkii oo dhammu ku
noqdeen Yeruusaalem.

**13** Markaasaa Absaaloom ina Daa'uud wuxuu lahaa
gabadh walaashiis ah oo suurad qurxoon, oo
magaceedana waxaa la odhan jiray Taamaar; oo Amnoon
oo ahaa ina Daa'uud ayaa caashaqay. 2 Oo Amnoon ayaa
u dhibtooday oo u bukooday walaashiis Taamaar, waayo,
iyadu bikrad bay ahayd; Amnoonna dhib bay la noqotay inuu
wax ku sameeyo. 3 Laakiinse Amnoon wuxuu lahaa saaxiib,
magiciisa la odhan jiray Yoonaadaab, oo uu dhalay Shimcaah
oo ahaa Daa'uud walaalkiis; oo Yoonaadaabna nin sir badan
buu ahaa. 4 Markaasuu ku yidhi, Ina boqorow, maxaad
maalinba maalinta ka dambaysa sidan ugu caatoobaysaa?
War maad ii sheegtid? Kolkaasaa Amnoon wuxuu ku yidhi,
Waxaan caashaqay Taamaar oo ah walaalkay Absaaloom
walaashiis. 5 Markaasaa Yoonaadaab ku yidhi, Sariirtaada
ku jiifso oo iska dhig sidii mid buka, oo markii aabbahaa
kuu yimaado, waxaad ku tidhaahdaa, Waan ku baryayaaye
walaashay Taamaar ha ii timaado, oo cunto ha i siiso, oo
cuntadana hortayda ha ku samayso, aan iska fiirsadee,
oo aan gacanteedana ku cunee. 6 Sidaas daraaddeed
Amnoon wuu jiifay, oo wuxuu iska dhigay sidii mid buka,
oo markii boqorkii u yimid ayaa Amnoon boqorkii ku yidhi,
Waan ku baryayaaye walaashay Taamaar ha ii timaado,
oo hortayda ha iigu samayso laba xabbadood oo moofa
ah, oo aan gacanteeda ku cunee. 7 Markaasaa Daa'uud
Taamaar gurigii ugu cid diray, oo ku yidhi, Orod oo waxaad
tagtaa gurigii walaalkaa Amnoon, oo isaga cunto u samee. 8
Sidaas daraaddeed Taamaar gurigii walaalkeed Amnoon
ayay tagtay; oo isna wuu iska jiifay. Markaasay qaadday
cajiin, wayna cajiintay, oo hortiisay moofa ku samaysay,
markaasay moofadiina dubtay. 9 Oo intay digsigii qaadday
ayay hortiisa ku soo shubtay; laakiinse wuu diiday inuu
cuno. Markaasaa Amnoon yidhi, Dadka oo dhan dibadda
iiga bixiya. Iyana dibadday uga wada baxeen. 10 Kolkaasaa
Amnoon wuxuu Taamaar ku yidhi, Cuntada qolka iigu
keen, aan gacantaada ku cunee. Markaasay Taamaar
qaadday moofadii ay samaysay, oo walaalkeed Amnoon
qolka ugu keentay. 11 Oo markay u soo dhowaysay inuu
cuno ayuu iyadii qabsaday, oo wuxuu ku yidhi, Walaalay,
kaalay ila seexo! 12 Oo waxay ugu jawaabtay, Maya,
walaalkayow, ha i xoogin; waayo, waxan oo kale in reer
binu Israa'iil lagu dhex sameeyo ma habboona, haddaba
nacasnimadan ha samayn. 13 Waayo, bal xaggee baan
geeynayaa ceebtayda? Oo adiguna waxaad noqonaysaa
nacasyada reer binu Israa'iil midkood. Haddaba waan ku
baryayaaye, bal boqorka la hadal, waayo, isagu ii kaa diidi
maayo. 14 Habase yeeshee wuu diiday inuu codkeedii
maqlo, laakiinse wuu xoogay oo la seexday, waayo, wuu ka
xoog badnaa. 15 Markaasaa Amnoon iyadii si aad iyo aad
u weyn u nebcaaday, waayo, nacaybkuu u qabay wuu ka
sii weynaa caashaquu caashaqay. Markaasaa Amnoon ku
yidhi, Kac, oo iga tag. 16 Kolkaasay ku tidhi, Maya, saas ma
aha, maxaa yeelay, xumaantan weyn ee aad igu bixinayso
ayaa ka sii liidata tii kale ee aad igu samaysay. Laakiinse
ma uu dhegaysan. 17 Markaasuu u yeedhay midiidinkiisii u
adeegayay, oo ku yidhi, Naagtan hadda dibadda iiga saar,
oo albaabkana ka soo daba xidh. 18 Oo iyana waxay qabtay
dhar midabyo kala duwan leh, waayo, dhar caynkaas ah ayay
gabdhaha boqorka ee bikradaha ahu qabi jireen. Markaasaa
addoonkiisii dibadda u soo saaray, oo albaabkiina ka soo
daba xidhay. 19 Markaasaa Taamaar waxay madaxa ku
shubatay dambas, oo ay jeexjeexday dharkii midabyada kala
duwan lahaa oo ay qabtay; madaxayna gacmaha saartay,
wayna iska tagtay iyadoo aad u ooyaysa. 20 Markaasaa
walaalkeed Absaaloom wuxuu ku yidhi, Ma waxaa kula jiray
walaalkaa Amnoon? Haddaba walaalay, bal iska aamus, oo
waxan qalbiga ha ku qabsan, waayo, isagu waa walaalkaa.
Sidaas daraaddeed Taamaar waxay ku hadhay oo ku
cidlowday gurigii walaalkeed Absaaloom. 21 Laakiinse
Boqor Daa'uud markuu waxyaalahan oo dhan maqlay, ayuu
aad u cadhooday. 22 Oo Absaaloomna Amnoon kulama
hadlin xumaan iyo samaan toona, waayo, Absaaloom wuu
nebcaaday Amnoon, maxaa yeelay, walaashiis Taamaar
buu xoogay. 23 Oo laba sannadood markay buuxsameen
dabadood Absaaloom wuxuu lahaa kuwo idaha dhogorta uga
xiira oo jooga Bacal Xasoor, oo ku taal Efrayim dhinaciisa, oo
Absaaloomna martiqaad buu ugu yeedhay wiilashii boqorka
oo dhan. 24 Oo Absaaloom boqorkii buu u yimid, oo ku yidhi,
Bal eeg, idihii ayaan dhogorta ka xiiranayaa, haddaba waan
ku baryayaaye, boqorow, adiga iyo addoommadaaduba i
soo raaca anoo addoonkaaga ah. 25 Markaasaa boqorkii

wuxuu Absaaloom ku yidhi, Wiilkaygiiyow saas ma aha,
ee yaannan kulligayo wada tegin, waaba intaasoo aannu
culaab kugu noqonnaaye. Oo isna wuu ku sii adkeeyey,
habase yeeshee wuu diiday inuu raaco, laakiinse wuu u
duceeyey. **26** Markaasaa Absaaloom wuxuu yidhi, Haddaba
haddaanay saas ahayn, ii daa walaalkay Amnoon ha i
raacee. Kolkaasaa boqorkii wuxuu ku yidhi, Muxuu kuu
raacayaa? **27** Laakiinse Absaaloom wuu ku sii adkeeyey
inuu u daayo Amnoon iyo wiilashii boqorka oo dhammuba
inay raacaan. **28** Markaasaa Absaaloom midiidinnadiisii
amray, oo ku yidhi, Haddaba ogaada markii Amnoon intuu
khamriga cabbo ku farxo, oo aan idinku idhaahdo, Amnoon
dila, markaas waa inaad dishaan, hana baqina, waayo, sow
anigu idinkuma amrin? Saas aawadeed dhiirranaada oo xoog
yeesha. **29** Oo midiidinnadii Absaaloomna waxay Amnoon
ku sameeyeen wixii Absaaloom ku amray. Markaasaa
wiilashii boqorka oo dhammu wada kaceen, oo nin waluba
wuxuu fuulay baqalkiisii, wayna wada carareen. **30** Oo
intay sii socdeen ayaa war u yimid Daa'uud, oo waxaa
lagu yidhi, Absaaloom wuxuu laayay wiilashii boqorka oo
dhan, oo mid qudhuhuna kama hadhin. **31** Markaasaa
boqorkii kacay, oo dharkiisii jeexjeexay, oo dhulkuu ku
jiifsaday, oo addoommadiisii oo dhammuna agtiisa soo
istaageen iyagoo dharkoodii jeexjeexay. **32** Markaasaa
Yoonaadaab, oo ahaa ina Shime'aah Daa'uud walaalkiisii
ayaa ugu jawaabay, Sayidkaygiiyow, ha moodin in la wada
laayay wiilashii boqorka oo dhan, laakiinse waxaa dhintay
Amnoon oo keliya, waayo, Absaaloom taas wuu goostay,
wuuna ku talo jiray tan iyo maalintii uu Amnoon xoogay
walaashiis Taamaar. **33** Haddaba, boqorow, sayidkaygiiyow,
waxan qalbiga ha ku qabsan, oo ha moodin in wiilashaadii
ay wada dhinteen, laakiinse waxaa dhintay Amnoon oo
keliya. **34** Laakiinse Absaaloom wuu cararay. Markaasaa
ninkii dhallinyarada ahaa ee gaadhka hayay indhaha kor
u qaaday, oo wax fiiriyey, oo wuxuu arkay dad badan oo
ka soo socda jidka mara buurta dhinaceeda meel isaga ka
dambaysa. **35** Markaasaa Yoonaadaab wuxuu boqorkii ku
yidhi, Bal eeg, boqorow, wiilashaadii waa yimaadeen, oo
sidii anoo addoonkaaga ahu aan kugu idhi, way noqotay.
**36** Oo isla haddiiba markuu hadalkii dhammeeyey ayay
wiilashii boqorku yimaadeen, codkoodiina kor bay u qaadeen,
oo ooyeen, oo boqorkii iyo addoommadiisiina aad bay u
ooyeen. **37** Laakiinse Absaaloom wuu cararay, oo u tegey
boqorkii Geshuur oo ahaa Talmay ina Cammiixuur. Oo
maalin kastaba Daa'uud wiilkiisii ayuu u barooranayay. **38**
Sidaasuu Absaaloom u cararay, oo Geshuur u tegey, oo
saddex sannadood buu halkaas joogay. **39** Boqor Daa'uudna
aad buu ugu xiisooday inuu u tago Absaaloom; waayo, wuu
ka samray Amnoon, maxaa yeelay, wuu dhintay.

**14** Markaasaa Yoo'aab oo ay Seruuyaah dhashay ayaa
ogaaday in boqorka qalbigiisii Absaaloom la jiro. **2**
Markaasaa Yoo'aab u cid diray Teqooca, oo wuxuu halkaas
uga yeedhay naag caqli badan, oo ku yidhi, Waan ku
baryayaaye, waxaad iska dhigtaa sidii mid barooranaysa,
oo waan ku baryayaaye, waxaad xidhataa dharkii baroorta,
saliidna ha ku subkan, laakiinse waxaad noqotaa sidii naag
wakhti dheer ku ka dhintay u barooranaysay; **3** oo waxaad
u gashaa boqorka, oo sidan ula hadal. Sidaasuu Yoo'aab
erayadii afka ugu riday. **4** Oo naagtii reer Teqooca markay
boqorkii la hadashay ayay dhulka wejiga saartay oo u
sujuudday, oo waxay ku tidhi, Boqorow, i caawi. **5** Markaasaa
boqorkii wuxuu ku yidhi, Naa maxaa kugu dhacay? Oo
iyana waxay ugu jawaabtay, Sida runta ah waxaan ahay
naag carmal ah, oo ninkaygiina waa dhintay. **6** Oo anoo
addoontaadii ahuna waxaan lahaa laba wiil, oo labadoodii
ayaa ku diriray duurka, oo wax kala qabtaana lama jirin;
markaasaa midkood kii kale wax ku dhuftay, wuuna dilay.
**7** Oo bal eeg, anoo addoontaada ah waxaa igu kacay
reerkii oo dhan, oo waxay igu yidhaahdeen, Noo keen kii
walaalkiis dilay, aannu walaalkiis oo uu nafta ka qaaday
daraaddiis u dilnee, oo aannu kan dhaxalka lehna dilnee; oo
saasna waxay u bakhtiin doonaan dhuxushii ii hadhay, oo
ninkaygana dhulka uguma ay reebi doonaan magac iyo wax
u hadha toona. **8** Markaasaa boqorkii naagtii ku yidhi, Orod
oo gurigaagii tag, oo amar kugu saabsan baan bixin doonaa.
**9** Naagtii reer Teqoocana waxay boqorkii ku tidhi, Boqorow,
Sayidkaygiiyow, dembigu ha saarnaado aniga iyo reerka
aabbahayba; oo adiga iyo carshigaaguna ka eed la'aada,
boqorow. **10** Boqorkiina wuxuu yidhi, Ku alla kii kula hadla, ii
keen oo isna mar dambe ku taaban maayo. **11** Markaasay
tidhi, Waan ku baryayaaye, Boqorow, xusuuso Rabbiga
Ilaahaaga ah, si kan dhiig u aaraa uusan mar dambe wax u
dilin, waaba intaasoo ay wiilkayga dilaane. Oo isna wuxuu
ku yidhi, Nolosha Rabbigaan ku dhaartaye inaan wiilkaaga
tin keli ahi dhulka kaga dhacayn. **12** Markaasaa naagtii
tidhi, Waan ku baryayaaye, anoo addoontaada ah, aan eray
kugula hadlo, boqorow sayidkaygiiyow. Isna wuxuu yidhi,
Bal ku hadal. **13** Naagtiina waxay tidhi, Maxaad ugu fikirtay
wax sidaas ah oo dadka Ilaah ka gees ah? Waayo, waxan
aad ku hadlaysay daraaddii, boqorow, waxaad tahay sida
mid gardaran, maxaa yeelay, mar dambe reerkii kuma aad
soo celin kaagii aad eriday, boqorow. **14** Waayo, kolleyba
dhammaanteen waan dhimanaynaa, oo waxaannu la mid

nahay sidii biyo dhulka ku daatay, oo aan mar dambe la
soo ururin karin; oo Ilaahna nafta ma qaado, laakiinse si
fiican buu u talaggalaa, si uusan kii xaggiisa laga eryay u
noqonin ku isaga ka go'ay. **15** Sidaas daraaddeed ayaan
kuugu imid, boqorow, sayidkaygiiyow, inaan eraygan kugula
hadlo; maxaa yeelay, dadkaa i cabsiiyey, markaasaan anoo
addoontaada ah is-idhi, Haatan waxaan la hadlayaa boqorka,
waayo, waaba intaasoo uu boqorku ii yeelaa waxaan
weyddiisto anoo addoontiisa ah. **16** Waayo, boqorku wuu i
maqli doonaa, inuu anoo addoontiisa ah iga samatabbixiyo
gacantii ninkii doonayay inuu na baabbi'iyo oo dhaxalka
Ilaahna naga saaro aniga iyo wiilkaygaba. **17** Haddaba
anoo addoontaada ah waxaan idhi, Boqorka sayidkayga
ah hadalkiisu ha ahaado mid i nasiya, waayo, boqorka
sayidkayga ahu sida malaa'igta Ilaah ayuu u kala gartaa
xumaanta iyo samaanta. Rabbiga Ilaahaaga ahuna ha kula
jiro. **18** Markaasaa boqorkii naagtii ugu jawaabay, Waan ku
baryayaaye waxa aan ku weyddiin doono, waxba ha iga
qarin. Oo naagtiina waxay tidhi, Boqorow, sayidkaygiiyow,
bal iska hadal. **19** Boqorkiina wuxuu yidhi, Waxyaalahan
oo dhan ma Yoo'aab baa kugu weheliya? Kolkaasaa
naagtii ugu jawaabtay, Boqorow, sayidkaygiiyow, naftaada
nool baan ku dhaartaye inaan ninna xagga midigta ama
xagga bidixda uga leexan karin waxaad tidhi, boqorow,
sayidkaygiiyow, waayo, addoonkaaga Yoo'aab ah ayaa igu
amray waxan, oo erayadan oo dhanna isagaa afka iigu
riday, anoo addoontaada ah. **20** Addoonkaaga Yoo'aab ahu
wuxuu waxan u sameeyey inuu xaalka si kale u beddelo
aawadeed. Sayidkaygiiyow, caqli baad leedahay, waxaanad
leedahay xigmad sida tan malaa'igta Ilaah oo kale ah, oo
waxaad garan kartaa waxyaalaha dhulka ku jira oo dhan.
**21** Markaasaa boqorkii wuxuu Yoo'aab ku yidhi, Bal eeg,
waxan baan sameeyey; haddaba tag, oo soo celi ninkii
dhallinyarada ahaa ee ahaa Absaaloom. **22** Kolkaasaa
Yoo'aab dhulka wejiga saaray, oo sujuuday, oo boqorkii u
duceeyey; wuxuuna Yoo'aab yidhi, Boqorow, sayidkaygiiyow,
maanta anoo addoonkaaga ah waan ogahay inaan raallinimo
kaa helay, waayo, boqorow, waad ii yeeshay wixii aan ku
weyddiistay, anoo addoonkaaga ah. **23** Sidaas daraaddeed
Yoo'aab wuu kacay, oo Geshuur tegey, oo Absaaloomna
Yeruusaalem buu keenay. **24** Markaasaa boqorkii yidhi,
Gurigiisii ha ku noqdo, laakiinse yuusan wejigayga arkin.
Saas aawadeed Absaaloom wuxuu ku noqday gurigiisii,
mana uu arkin boqorka wejigiisii. **25** Haddaba reer binu
Israa'iil oo dhan laguma arag nin Absaaloom la mid ah oo
quruxdiisa aad loogu ammaano, waayo, cagtiisa cad ilaa
dhaladiisa innaba iin laguma arag. **26** Haddaba timihiisu
way ku cuslaayeen, oo sannad kasta dhammaadkeeda
ayuu iska jari jiray, oo markuu timaha madaxiisa jaro wuu
miisaami jiray oo miisaankoodu wuxuu ahaa laba boqol
oo sheqel ee ah miisaanka boqorka. **27** Oo Absaaloom
waxaa u dhashay saddex wiil, iyo gabadh magaceeda
la odhan jiray Taamaar, oo iyana waxay ahayd naag
suurad qurxoon. **28** Oo Absaaloomna Yeruusaalem laba
sannadood oo dhan ayuu degganaa, mana uu arag wejigii
boqorka. **29** Markaasaa Absaaloom u cid dirtay Yoo'aab inuu
boqorka u diro; laakiinse wuu diiday inuu u yimaado; oo
haddana mar labaad buu u cid dirtay, laakiinse wuu diiday
inuu yimaado. **30** Sidaas daraaddeed Absaaloom wuxuu
addoommadiisii ku yidhi, Bal eega, Yoo'aab beertiisu waxay u
dhow dahay tayda, oo waxaa ugu taal shaciir; haddaba taga
oo dab qabadsiiya. Markaasaa Absaaloom addoommadiisii
beertii dab qabadsiiyeen. **31** Dabadeedna Yoo'aab baa soo
kacay oo Absaaloom gurigiisii ugu yimid, oo ku yidhi, War
addoommadaadu maxay beertayda dab u qabadsiiyeen?
**32** Absaaloomna wuxuu Yoo'aab ugu jawaabay, Bal eeg
waan kuu soo cid dirtay inaad ii timaadid, waayo, waxaan
doonayay inaan boqorka kuu dirto oo aan ku idhaahdo, Bal
maxaan Geshuur uga imid? Waayo, waxaa ii roonayd inaan
halkaas sii joogo, haddaba sidaas daraaddeed i daa aan
boqorka wejigiisa soo arkee; oo haddaan dembi leeyahayna,
isagu ha i dilo. **33** Sidaas daraaddeed Yoo'aab baa boqorkii
u yimid, wuuna u sheegay, oo markuu Absaaloom u yeedhay
ayuu isna boqorkii u yimid, oo intuu u sujuuday ayuu wejigiisa
dhulka saaray boqorka hortiisa; oo boqorkiina Absaaloom
buu dhunkaday.

**15** Oo taas dabadeedna Absaaloom ayaa diyaarsaday
gaadhifardood iyo fardo, iyo konton nin oo hortiisa
orodda. **2** Markaasaa Absaaloom aroortii kacay, oo ag
istaagay jidkii iridda, oo markuu nin dacwo qaba boqorka
xukun ugu imanayo ayuu Absaaloom u yeedhi jiray, oo
wuxuu ku odhan jiray, Magaaladee baad ka timid? Oo
isna wuxuu odhan jiray, Anoo addoonkaaga ah waxaan
ka mid ahay qabiilooyinka reer binu Israa'iil midkood. **3**
Markaasaa Absaaloom wuxuu ku odhan jiray, Xaalalkaagu
waa wanaagsan yihiin, waana qumman yihiin; laakiinse nin
boqorku amray oo ku maqlayaa ma jiro. **4** Oo Absaaloom
wuxuu kaloo yidhi, Way, bal maa aniga dalka xaakin la iiga
dhigo, si nin alla ninkii dacwo ama muraad lihi iigu yimaado
oo aan caddaalad ugu xukumo! **5** Oo waxay ahaatay in ninkii
inuu sujuudo ugu soo dhowaadaba, uu Absaaloom intuu
gacanta soo fidiyo oo qabto dhunkan jiray. **6** Oo reer binu
Israa'iil kii boqorka xukun ugu yimid oo dhan Absaaloom

sidaasuu ku samayn jiray dhammaantood; oo sidaasuu
Absaaloom qalbiga uga xaday dadkii reer binu Israa'iil. 7 Oo
markay afartan sannadood dhammaadeen ayaa Absaaloom
boqorkii ku yidhi, Waan ku baryayaaye, i sii daa aan Xebroon
tagee, waayo, waxaan doonayaa inaan halkaas ku bixiyo
nidar aan Rabbiga u galay. 8 Waayo, anoo addoonkaaga
ah nidar baan galay intii aan joogay Geshuur oo ku taal
Suuriya, oo waxaan idhi, Haddii Rabbigu Yeruusaalem mar
kale igu celiyo, markaasaan Rabbiga allabari u bixin doonaa.
9 Boqorkiina wuxuu ku yidhi, Nabad ku tag. Kolkaasuu kacay
oo tegey Xebroon. 10 Laakiinse Absaaloom jaajusiin buu u
diray qabiilooyinkii reer binu Israa'iil oo dhan, oo wuxuu ku
yidhi, Markaad buunka dhawaaqiisa maqashaan, waxaad
tidhaahdaan, Absaaloom waa ku boqramay Xebroon. 11 Oo
Absaaloomna Yeruusaalem waxaa ka raacay laba boqol oo
nin, oo la marti qaaday, oo waxay tageen iyagoo xog la', oo
aan waxba ogayn. 12 Oo Absaaloomna wuxuu magaaladii
Giloh ahayd ugu cid dirsaday Axiitofel kii reer Giloh, oo ahaa
Daa'uud taliyihiisa, intuu allabarigii bixinayay. Oo sirqoolkiina
aad buu u xoog badnaa; waayo, dadkii Absaaloom la jiray
way soo kordhayeen had iyo goorba. 13 Oo markaasaa
Daa'uud waxaa u yimid wargeeye; isagoo leh, Dadkii reer
binu Israa'iil qalbigoodii wuxuu raacay Absaaloom. 14
Daa'uudna wuxuu addoommadiisii Yeruusaalem la joogay
oo dhan ku yidhi, War ina kiciya aynu cararnee; haddii
kalese midkeenna Absaaloom ka baxsan maayo; haddaba
dhaqsada oo baxa, waaba intaasoo uu haddiiba ina soo
qabtaaye, oo belaayo inagu ridaaye, oo uu magaaladana seef
ku laayaaye! 15 Markaasaa boqorka addoommadiisii boqorkii
ku yidhaahdeen, Bal eeg, annagoo ah addoommadaadu
diyaar baannu u nahay inaannu samayno wax kasta oo
aad doorato, boqorow, sayidkayagiiyow. 16 Markaasaa
boqorkii baxay, isagoo reerkiisii oo dhammu daba socdaan.
Oo boqorkii toban naagood oo addoommo ahaa ayuu uga
tegey inay gurigii dhawraan. 17 Boqorkiina wuu baxay, oo
dadkii oo dhammuna isagay daba socdeen; oo meel fog
bay joogsadeen. 18 Oo addoommadiisii oo dhammuna way
dhinac mareen, iyaga iyo reer Kereetiim oo dhan, iyo reer
Feleetii oo dhan, iyo reer Gad oo dhan, kuwaasoo ahaa lix
boqol oo nin oo Gad ka soo raacday, dhammaantood boqorkii
way hor mareen. 19 Markaasaa boqorkii wuxuu ku yidhi Itay
oo ahaa reer Gad, War adiguna maxaad noola socotaa?
Noqo, oo boqorka la joog; waayo, adigu waxaad tahay
qariib, iyo weliba mid waddankiisii laga soo masaafuriyey. 20
Waxaad timid shalayto, haddaba sidee baan maanta noola
kaa warwareejiyaa? Maxaa yeelay, anigu waxaan tegayaa
meel alla meeshaan doonayoba, haddaba naga noqo, oo
walaalahaana dib u celi; oo naxariis iyo runuba ha kula jireen.
21 Markaasaa Itay wuxuu boqorkii ugu jawaabay, Waxaan
ku dhaartay Rabbiga noloshiisa, iyo noloshaada, boqorow,
sayidkaygiiyow, sida runtaa meel alla meeshii aad joogtid,
ama aan noolaado ama aan dhintee, anoo addoonkaaga
ahuna halkaasaan joogayaa. 22 Kolkaasaa Daa'uud wuxuu
Itay ku yidhi, Haddaba tag oo gudub. Markaasaa Itay kii
reer Gadna gudbay, isagii iyo raggiisii oo dhan, iyo yaryarkii
la socday oo dhan. 23 Oo waddankii oo dhanna waxaa
lagaga ooyay cod weyn, oo dadkii oo dhammuna webigii
way ka gudbeen; oo boqorka qudhiisii wuu ka gudbay toggii
Qidroon, oo dadkii oo dhammuna waxay u gudbeen xagga
cidlada. 24 Oo bal eeg, Saadooqna waa yimid, isagoo ay
la socdaan reer Laawi oo dhan, oo sida sanduuqii axdiga
Ilaah, markaasay sanduuqii Ilaah dhigeen, oo Aabyaataarna
kor buu tegey, ilaa dadkii oo dhammu ay magaaladii ka
soo gudbeen. 25 Markaasaa boqorkii wuxuu Saadooq ku
yidhi, Sanduuqa Ilaah qaad oo magaaladii ku celi. Hadduu
Rabbigu raalli iga yahay, mar kaluu i soo celin doonaa, oo
wuu i tusi doonaa isaga iyo rugta Ilaahba. 26 Laakiinse
hadduu igu yidhaahdo, Kuguma faraxsani; bal eeg, haddaba
waa i kane, ha igu sameeyo sidii isaga la wanaagsan. 27
Oo haddana boqorkii wuxuu wadaadkii Saadooq ahaa ku
yidhi, Sow adigu wax arke ma tihid? Haddaba magaaladii
ku nabad noqda, idinka iyo labadiinna wiil ee idinla jirta,
kuwaas oo ah wiilkaaga Axiimacas iyo Yoonaataan oo ah
ina Aabyaataar. 28 Oo anna waxaan sii joogayaa meesha
mareenka ah ee cidlada loogu sii gudbo, jeeruu war iiga kiin
yimaado. 29 Sidaas daraaddeed Saadooq iyo Aabyaataar
sanduuqii Ilaah bay qaadeen, waxayna mar kale ku celiyeen
Yeruusaalem, oo iyana halkaasay iska sii joogeen. 30 Oo
Daa'uudna wuxuu fuulay jiirtii Buur Saytuun oo intuu sii
socdayna wuu ooyayay, isagoo hagoogan, oo caga cad,
oo dadkii la jiray oo dhammuna midkood waluba wuu
hagoogtay, oo kor bay tageen, iyagoo ooyaya intay kor
u sii socdeen. 31 Oo Daa'uud waxaa loo soo sheegay
inuu Axiitofelna Absaaloom kula jiro shirqoolkii. Markaasaa
Daa'uud wuxuu yidhi, Rabbiyow, waan ku baryayaaye,
Axiitofel taladiisa nacasnimo u beddel. 32 Oo markii Daa'uud
yimid jiirta dusheedii, meeshii Ilaah lagu caabudi jiray, waxaa
u yimid Xuushay kii reer Arkii oo jubbaddiisii jeexjeexay,
oo madaxana ciid ku shubtay. 33 Markaasaa Daa'uud ku
yidhi, Haddaad i raacdo oo aad ila gudubto, culays baad igu
noqonaysaa; 34 laakiinse haddaad magaaladii ku noqotid,
oo aad Absaaloom ku tidhaahdid, Boqorow, addoonkaagii
baan noqonayaa; oo sidaan hore aabbahaa addoonka ugu
ahaan jiray, ayaan haddana adiga addoon kuugu ahaanayaa;

markaas waxaad iiga adkaanaysaa talada Axiitofel. 35 Oo
halkaasna sow kulama joogaan wadaaddadii ahaa Saadooq
iyo Aabyaataar? Sidaas daraaddeed wax alla wixii aad
guriga boqorka ka maqashoba, waxaad u soo sheegtaa
wadaaddadii ahaa Saadooq iyo Aabyaataar. 36 Oo iyana
waxay halkaas ku haystaan labadoodii wiil oo ahaa Axiimacas
ina Saadooq, iyo Yoonaataan ina Aabyaataar; oo iyaga
waxaad iigu soo dhiibtaan wax alla wixii aad maqashaanba.
37 Sidaas daraaddeed Xuushay oo ahaa Daa'uud saaxiibkiis
magaaladii buu soo galay; oo Absaaloomna Yeruusaalem
buu soo galay.

**16** Oo Daa'uud markuu in yar dhaafay jiirta dusheedii
waxaa u yimid Siibaa oo ahaa midiidinkii Mefiiboshed,
isagoo wada laba dameer oo kooraysan, oo dushoodana
waxaa u saarnaa laba boqol oo xabbadood oo kibis ah, iyo
boqol rucubood oo sabiib ah, iyo boqol rucubood oo midho
xagaa ah, iyo sibraar khamri ah. 2 Markaasaa boqorkii wuxuu
Siibaa ku yidhi, War waxyaalahan maxaad ula jeeddaa?
Oo Siibaana wuxuu yidhi, Dameeraha waxaan u keenay in
boqorka reerkiisu fuulaan; kibista iyo midhahana waxaan
u keenay in ragga dhallinyarada ahu cunaan; khamrigana
waxaan u keenay in ku alla kii cidlada ku itaal darnaadaa
uu cabbo. 3 Markaasaa boqorkii ku yidhi, Meeh wiilkii
sayidkaagu? Siibaana boqorkii buu ku yidhi, Yeruusaalem
buu ku hadhay, oo wuxuu yidhi, Reer binu Israa'iil maantay ii
soo celin doonaan boqortooyadii aabbahay. 4 Markaasaa
boqorkii wuxuu Siibaa ku yidhi, Bal eeg, Mefiiboshed wixiisa
oo dhan adigaa iska leh. Oo Siibaana wuxuu yidhi, Boqorow,
sayidkaygiiyow, waan ku sujuudayaa hortaada; aan raallinimo
kaa helo. 5 Oo Boqor Daa'uudna markuu Baxuuriim yimid,
waxaa ku soo baxay nin ay Saa'uul isku cid ahaayeen, oo
magiciisa la odhan jiray Shimcii ina Geeraa. Wuu soo baxay,
isagoo habaartamaya intuu soo socday. 6 Oo dhagxan
buuna ku tuuray Daa'uud iyo addoommadii Boqor Daa'uud
oo dhanba, oo dadkii oo dhan iyo raggii xoogga lahaa oo
dhammuna waxay joogeen midigtiisa iyo bidixdiisaba. 7 Oo
Shimcii markuu habaartamayay wuxuu lahaa, Naga tag, nin
yahow dhiigga qabaa, oo naga tag, nin yahow waxmataraha
ihi! 8 Rabbigu waa ku kor saaray reer Saa'uul dhiiggoodii oo
dhan, Saa'uulkaasoo aad meeshiisii xukumayso; oo Rabbigu
boqortooyadii gacantuu u geliyey wiilkaaga Absaaloom; oo
bal eeg, adiga belaayadaadii baa kula tagtaye, maxaa yeelay,
waxaad tahay nin dhiig qaba. 9 Markaasaa Abiishay oo ay
Seruuyaah dhashay wuxuu boqorkii ku yidhi, War eeygan
dhintay muxuu kuu habaarayaa, boqorow, sayidkaygiiyow?
Waan ku baryayaaye, i daa intaan u tago aan madaxa ka
gooyee. 10 Kolkaasaa boqorkii wuxuu yidhi, Kuwiinna ay
Seruuyaah dhashayow, bal maxaa inoo dhexeeya? Hadduu
habaartamay, oo Rabbigu ku yidhi, Daa'uud soo habaar, bal
yaa ninkan ku odhan kara, War maxaad saas u yeeshay? 11
Daa'uudna wuxuu ku yidhi Abiishay, iyo addoommadiisii oo
dhanba, Bal eega, wiilkaygii iga soo baxay ayaa doonaya
inuu nafta iga qaado; haddaba intee in ka badan ayaa
ninkan reer Benyaamiin igu samaynayaa? Haddaba ninkan
iska daaya, ha iska habaartamee; waayo, Rabbigaa saas
ku amray. 12 Mindhaa Rabbigu intuu dhibaatadayda eego
ayuu wanaag iigu beddeli doonaa habaarkuu maanta igu
habaaray. 13 Sidaas daraaddeed Daa'uud iyo raggiisiiba
jidkii bay mareen, Shimciina wuxuu maray buurtii agtiisa
ahayd dhinaceeda, oo intuu sii socdayna Daa'uud buu
habaarayay, oo dhagxan ku tuurayay, ciidna wuu ku soo
saydhayay. 14 Oo boqorkii iyo dadkii isaga la jiray oo
dhammu waxay yimaadeen iyagoo daalay; halkaasuuna
ku nastay. 15 Markaasaa Absaaloom iyo dadkii reer binu
Israa'iil oo dhammu Yeruusaalem yimaadeen, iyagoo uu
Axiitofel la socdo. 16 Oo kolkii Xuushay kii reer Arkii oo
Daa'uud saaxiibkiis ahaa uu Absaaloom u yimid ayaa
Xuushay Absaaloom ku yidhi, Boqorku ha noolaado, boqorku
ha noolaado. 17 Markaasaa Absaaloom wuxuu Xuushay
ku yidhi, Ma sidatanaad ugu roonaanaysaa saaxiibka?
Maxaadse saaxiibkaa u raaci weyday? 18 Xuushayna wuxuu
Absaaloom ku yidhi, Saas ma aha; laakiinse kii Rabbiga, iyo
dadkan, iyo reer binu Israa'iil oo dhammu doorteen ayaa i
lahaanaya, oo isagaan la joogayaa. 19 Oo haddana, bal
yaan u adeegaa? Sow wiilkiisa ma aha? Sidaan aabbahaa
ugu adeegi jiray oo kale ayaan haatanna adiga kuugu
adeegayaa. 20 Markaasaa Absaaloom wuxuu Axiitofel ku
yidhi, Bal ka tali waxaan samayn lahayn. 21 Oo Axiitofelna
wuxuu Absaaloom ku yidhi, Waxaad u tagtaa naagaha
addoommaha ah ee aabbahaa, ee uu uga tegey inay guriga
dhawraan; oo reer binu Israa'iil oo dhammuna waxay maqli
doonaan in aabbahaa ku karahsaday; dabadeedna inta
kula jirta oo dhan gacmahoodu way xoogaysan doonaan.
22 Sidaas daraaddeed Absaaloom teendhay uga dhiseen
guriga dushiisa, oo Absaaloomna wuxuu u tegey naagihii
addoommaha ahaa ee aabbihiis, iyadoo ay reer binu Israa'iil
oo dhammu u jeedeen. 23 Oo waayahaasna taladii Axiitofel
ku talin jiray waxay ahayd sidii Ilaah hadalkiisa markii Ilaah
wax la weyddiisto oo kale; oo Axiitofel taladiisuna saasay la
ahayd Daa'uud iyo Absaaloomba.

**17** Oo weliba Axiitofel wuxuu Absaaloom ku yidhi, I
daa aan laba iyo toban kun oo nin doortee oo aan

caawa Daa'uud eryadee, 2 oo waxaan u imanayaa intuu
daallan yahay oo gacmihiisu taag daranyihiin, markaasaan
cabsiinayaa, oo dadka isaga la jira oo dhammuna way
carari doonaan. Markaasaan dili doonaa boqorka oo keliya.
3 Oo dadka oo dhanna waan kuu soo celin doonaa, oo
ninka aad doonaysaa waa sidii iyadoo ay dhammaan soo
wada noqdeen; markaasay dadka oo dhammu nabad ku
noolaan doonaan. 4 Oo hadalkaasuna aad buu uga farxiyey
Absaaloom iyo odayaashii reer binu Israa'iil oo dhan. 5
Markaasaa Absaaloom wuxuu yidhi, Bal haddana iigu yeedh
Xuushay kii reer Arkii, oo bal aan maqalno wuxuu isagu
leeyahay. 6 Markaasaa Xuushay u yimid Absaaloom, oo
Absaaloomna intuu la hadlay ayuu ku yidhi, Axiitofel sidan
buu ku hadlay. Haddaba siduu nagu yidhi ma yeelnaa?
Haddii kale, adigu hadal. 7 Kolkaasaa Xuushay wuxuu
Absaaloom ku yidhi, Axiitofel talada uu markan ku taliyey ma
fiicna. 8 Oo weliba Xuushay wuxuu yidhi oo kale, Waad
taqaannaa aabbahaa iyo raggiisaba inay rag xoog leh yihiin,
iyo in maankoodu u kulul yahay sidii orso ilmaheedii duurka
laga xaday, oo aabbahaana waa nin dagaalyahan ah, oo
dadkana meel la baryi maayo. 9 Oo bal eeg, hadda wuxuu
ku dhuumanayaa bohol, ama meel kale; oo markii qaarkood
la dilo marka hore, ku alla kii maqla ayaa odhan doona,
Ciidammadii Absaaloom raacay waa la laayay. 10 Oo xataa
kan xoog badan, ee qalbigiisu yahay sida qalbiga libaaxa,
wuu dhalaali doonaa dhammaantiis; waayo, reer binu Israa'iil
oo dhammu way og yihiin in aabbahaa yahay nin xoog
badan, iyo in kuwa isaga la jira ay yihiin rag daran. 11
Laakiinse anigu waxaan ku talinayaa in reer binu Israa'iil
oo dhammu adiga kuu soo shiraan oo ay ka yimaadaan
tan iyo Daan iyo ilaa Bi'ir Shebac, oo ay u soo bataan sida
cammuudda badda agteeda taal; oo aad adiga qudhaadu
dagaalka gashid. 12 Sidaasaynu isaga ugu iman doonnaa
meesha laga helo, oo waxaynu ugu soo degi doonnaa
sida dharabku dhulka ugu soo dego oo kale; oo isaga
iyo dadka la socda oo dhanba xataa mid qudha ka reebi
mayno. 13 Oo weliba hadduu magaalo galo, markaasay reer
binu Israa'iil oo dhammu xadhko soo qaadan doonaan, oo
waxaynu magaalada u jiidaynaa xagga webiga oo waan
ku ridaynaa, ilaa halkaas laga waayo xataa dhagax yar.
14 Markaasaa Absaaloom iyo raggii reer binu Israa'iil oo
dhammu waxay yidhaahdeen, Xuushay kii reer Arkii taladiisu
way ka wanaagsan tahay taladii Axiitofel. Waayo, Rabbigu
wuxuu ka dhigay in laga adkaado taladii wanaagsanayd
oo Axiitofel, si Rabbigu Absaaloom shar ugu soo dejiyo.
15 Markaasaa Xuushay wuxuu ku yidhi wadaaddadii ahaa
Saadooq iyo Aabyaataar, Axiitofel saas iyo saas buu ula
taliyey Absaaloom iyo odayaashii reer binu Israa'iil, oo anna
saas iyo saas baan ula taliyey. 16 Sidaas daraaddeed
haddiiba u cid dira, oo Daa'uud u war geeya, oo waxaad ku
tidhaahdaan, Caawa ha ku baryin meelaha loogu gudbo
cidlada, laakiinse si alla si aad yeeshaba ka gudub; yaan
adiga iyo dadka kula socda oo dhanba la wada liqine,
boqorow. 17 Haddaba Yoonaataan iyo Axiimacas ma ay karin
inay magaalada bayaan u soo galaan, sidaas daraaddeed
waxay joogeen Ceyn Rogeel, oo gabadh addoon ah ayaa
intay u tagtay wax u sheegtay; oo iyana intay tageen ayay
boqor Daa'uud u soo warrameen. 18 Laakiinse wiil baa
arkay iyagii, oo wuxuu u soo sheegay Absaaloom, oo iyana
labadoodiiba haddiiba way carareen, oo waxay yimaadeen
nin Baxuuriim deggan gurigiis oo barxadda ceel ku leh;
oo iyana halkaasay ku dhaadhaceen. 19 Oo naagtiina
ceelka afkiisii bay wax ku gogoshay, oo waxay ku dul
firdhisay hadhuudh la tumay; oo waxbana lagama ogaan.
20 Oo addoommadii Absaaloom naagtii bay gurigii ugu
yimaadeen; oo waxay ku yidhaahdeen, Awaye Axiimacas iyo
Yoonaataan? Markaasaa naagtii waxay ku tidhi, War waxay
ka gudbeen togga biyaha. Oo iyana markay doondooneen
oo ay heli waayeen ayay ku noqdeen Yeruusaalem. 21
Oo markay tageen dabadeed ayay ceelkii ka soo baxeen,
oo ay tageen, oo ay Boqor Daa'uud u soo warrameen; oo
waxay Daa'uud ku yidhaahdeen, War ka kaca, oo haddiiba
biyaha gudba, waayo, Axiitofel sidaasuu talo kaa gees ah
ugu taliyey. 22 Markaasaa Daa'uud iyo dadkii isaga la jiray
oo dhammu kaceen, oo waxay ka gudbeen Webi Urdun; oo
markii waagii baryay ma jirin mid iyagii ah oo aan Webi Urdun
ka gudbin. 23 Oo Axiitofelna markuu arkay inaan taladiisii
la raacin ayuu dameerkii kooraystay, oo magaaladiisuu
tegey, oo intuu reerkiisii la dardaarmay, ayuu isdeldelay;
wuuna dhintay, oo waxaa lagu aasay qabrigii aabbihiis.
24 Oo Daa'uudna wuxuu yimid Maxanayim. Absaaloomna
wuxuu ka soo gudbay Webi Urdun, isagoo wata raggii reer
binu Israa'iil oo dhan. 25 Oo Absaaloomna wuxuu ciidankii
madax uga dhigay Camaasaa, oo Yoo'aab wuu ka beddelay.
Haddaba Camaasaa waxaa dhalay nin reer binu Israa'iil ah
oo magiciisa la odhan jiray Yitraa, oo wuxuu qabay Abiigayil
oo ay Naaxaash dhashay, oo waxay la dhalatay Seruuyaah
oo ahayd Yoo'aab hooyadiis. 26 Markaasaa Absaaloom iyo
reer binu Israa'iil waxay soo degeen dalkii Gilecaad. 27
Markii Daa'uud yimid Maxanayim waxaa u yimid Shobii oo
ahaa ina Naaxaash ee ahaa reer Cammoonkii degganaa
Rabbaah, iyo Maakiir oo ahaa ina Cammii'eel ee ahaa
reer Loo Debaar, iyo Barsillay oo ahaa reer Gilecaadkii
degganaa Rogeliim, 28 oo waxay u keeneen gogol, iyo

fijaanno, iyo weelal dhoobo ah, iyo sarreen, iyo shaciir, iyo
bur, iyo salool, iyo atar, iyo misir, iyo digir, 29 iyo malab, iyo
subag, iyo ido, iyo faar lo'aad, oo waxay waxaas oo dhan u
keeneen Daa'uud iyo dadkii la socday inay cunaan, waayo,
waxay isyidhaahdeen, Dadku cidladay ku gaajoodeen, oo ku
daaleen, oo ku harraadeen.

18 Markaasaa Daa'uud wuxuu tiriyey dadkii isaga la jiray,
oo wuxuu u yeelay saraakiil kun kun u taliya iyo
saraakiil boqol boqol u taliya. 2 Markaasaa Daa'uud dadkii
diray, oo wuxuu u qaybiyey saddex meelood, kolkaasuu meel
wuxuu u dhiibay Yoo'aab, meelna wuxuu u dhiibay Abiishay
oo ay Seruuyaah dhashay ee ahaa Yoo'aab walaalkiis, oo
meeshii kalena wuxuu u dhiibay Itay kii reer Gad. Markaasaa
boqorkii wuxuu dadkii ku yidhi, Sida xaqiiqada ah aniga
qudhayduna waan idin raacayaa. 3 Laakiinse dadkii waxay
yidhaahdeen, Waa inaanad bixin, waayo, annagu haddaannu
cararno dan nagama ay lahaan doonaan; oo xataa haddii
nuskayo dhintona dan nagama ay lahaan doonaan; laakiinse
adigu waad ka qiimo weyn tahay toban kun oo naga mid
ah; sidaas daraaddeed haatan waxaa wanaagsan inaad
adoo diyaar ah iska joogtid oo aad xagga magaalada naga
caawidid. 4 Boqorkiina wuxuu iyagii ku yidhi, Wax alla wixii
idinla wanaagsan ayaan samaynayaa. Kolkaasaa boqorkii
wuxuu istaagay iridda dhinaceeda, oo dadkii oo dhammuna
dibadday u baxeen iyagoo ah boqol boqol iyo kun kun. 5
Markaasaa boqorkii wuxuu amray Yoo'aab iyo Abiishay iyo
Itay, oo ku yidhi, Ninka dhallinyarada oo ah Absaaloom
aniga aawaday ugu naxariista. Oo dadka oo dhammuna
way maqleen markii boqorku saraakiisha oo dhan ku amray
wax Absaaloom ku saabsan. 6 Saas daraaddeed dadkii
dibadday u baxeen oo waxay reer binu Israa'iil kaga hor
tageen duurka, oo dagaalkiina wuxuu ka dhacay kayntii reer
Efrayim. 7 Oo dadkii reer binu Israa'iilna waxaa meeshaas
ku laayay addoommadii Daa'uud, oo maalintaas waxaa
la laayay dad badan, oo waxaa ka dhintay labaatan kun
oo nin. 8 Oo dagaalkiina wuxuu ku faafay waddankii oo
dhan, oo maalintaas waxaa kayntii cuntay dad ka sii badan
intii seeftu cuntay. 9 Absaaloomna si kedis ah ayuu uga
hor yimid addoommadii Daa'uud. Absaaloomna baqashiisii
ayuu fuushanaa, oo baqashiisii waxay hoos martay geed
weyn laamihiis, kolkaasaa geedkii madaxiisii qabsaday, oo
wuxuu ka lalmaday meel cirka iyo dhulka u dhaxaysa; oo
baqashii ku hoos jirtayna way iska socotay. 10 Markaasaa
nin arkay, oo Yoo'aab u soo sheegay, oo wuxuu ku yidhi,
War, waxaan soo arkay Absaaloom oo geed ka lalmada.
11 Yoo'aabna wuxuu ninkii u soo warramay ku yidhi, Oo
haddaad aragtay maxaad isaga halkaas ugu dili weyday? Oo
anna waxaan ku siin lahaa toban gogo' oo lacag ah iyo dhex-
xidh. 12 Markaasaa ninkii Yoo'aab ku yidhi, In kastoo aan
heli lahaa kun gogo' oo lacag ah, weliba ma aanan yeeleen
inaan gacantayda wiilka boqorka u qaado, waayo, annagoo
maqlayna ayaa boqorku idinku amray, adiga iyo Abiishay iyo
Itay, oo idinku yidhi, Iska jira oo yaan ninna taaban ninka
dhallinyarada ah ee Absaaloom ah. 13 Ama haddaan saas
samayn lahaa naftaydaan been kula macaamiloon lahaa,
waayo, boqorka waxba kama qarsoona, adiga qudhaaduna
waad igu kici lahayd. 14 Yoo'aabna wuxuu yidhi, Anigu saas
kugula sii joogi maayo. Markaasuu qaatay saddex gantaal,
oo Absaaloom wadnaha juq ka siiyey, isagoo weli nool
oo geedkii ku dhex jira. 15 Kolkaasaa waxaa Absaaloom
hareereeyey toban nin oo dhallinyaro ahaa oo Yoo'aab hub
u siday, oo intay dileen ayay gowraceen. 16 Markaasaa
Yoo'aab buunkii afuufay, oo dadkiina waxay ka soo noqdeen
eryadkii ay reer binu Israa'iil eryanayeen, waayo, Yoo'aab
baa u diiday. 17 Oo Absaaloom bay qaadeen oo ku tuureen
yamays dheer oo kaynta ku dhex yiil, oo waxay dusha
kaga tuuleen dhagaxyo faro badan, oo reer binu Israa'iilna
dhammaantood mid waluba teendhadiisii buu ku cararay. 18
Oo Absaaloomna intuu noolaa ayuu yidhi, Wiil magacayga
lagu soo xusuusto ma aan lihi. Sidaas daraaddeed wuxuu
qaaday tiir oo dhex qotomiyey dooxadii boqorka; oo tiirkiina
wuxuu ku magacaabay magiciisii, oo ilaa maantadan la joogo
waxaa lagu magacaabaa taalladii Absaaloom. 19 Markaasaa
Axiimacas oo ahaa ina Saadooq yidhi, Haddaba i daaya
aan ordee, oo aan boqorkii u soo warramee, sida Rabbigu
uga aarguday cadaawayaashiisii. 20 Kolkaasaa Yoo'aab
wuxuu ku yidhi, Adigu maanta ahaan maysid kan warka
qaadaya, laakiinse maalin kalaad qaadi doontaa, illowse
adigu maanta waxba war qaadi maysid, maxaa yeelay,
boqorka wiilkiisii baa dhintay. 21 Markaasaa Yoo'aab wuxuu
kii reer Kuush ku yidhi, Tag oo boqorkii u sheeg wixii aad
aragtay. Oo kii reer Kuushna intuu Yoo'aab u sujuuday ayuu
orday. 22 Markaasaa Axiimacas oo ahaa ina Saadooq ayaa
mar kale Yoo'aab ku yidhi, Wax kastaba ha dhaceene, waan
ku baryayaaye, i daa aan kii reer Kuush ka daba ordee. Oo
Yoo'aabna wuxuu ku yidhi, Wiilkaygiiyow, adigoon waxba
ku helayn warkan, bal maxaad u ordaysaa? 23 Wuxuuse
yidhi, Wax kastaa ha dhacee, waan ordayaa. Kolkaasuu ku
yidhi, Orod. Markaasaa Axiimacas wuxuu qaaday waddadii
Bannaanka, oo kii reer Kuushna wuu ka dheereeyey. 24
Oo Daa'uudna wuxuu fadhiyey labada irdood dhexdooda,
waardiyihiina wuxuu fuulay iridda saqafkeeda ilaa derbigii,
markaasuu wax fiiriyey, oo arkay nin keligiis soo ordaya.

25 Kolkaasaa waardiyihii dhawaaqay, oo boqorkii buu u
sheegay. Boqorkiina wuxuu yidhi, Hadduu keligiis yahay, war
buu sidaa. Oo isna wuu soo orday, wuuna soo dhowaaday.
26 Markaasaa waardiyihii arkay nin kale oo soo ordaya;
kolkaasaa waardiyihii u dhawaaqay iridjoogihii oo ku yidhi,
Bal eeg, nin kalaa keligiis soo ordaya. Oo boqorkiina wuxuu
yidhi, Isna war buu sidaa. 27 Markaasaa waardiyihii wuxuu
yidhi, Waxaan u malaynayaa inuu ninka hore orodkiisu u eg
yahay orodkii Axiimacas ina Saadooq. Markaasaa boqorkii
wuxuu yidhi, Isagu waa nin wanaagsan, wuxuu soo wadaa
war wanaagsan. 28 Markaasaa Axiimacas dhawaaqay,
oo boqorkii ku yidhi, Wax waluba waa hagaagsan yihiin.
Oo intuu boqorka hortiisii ku sujuuday ayuu wejiga dhulka
saaray, oo yidhi, Waxaa ammaan leh Rabbiga Ilaahaaga
ah, oo inoo soo gacangeliyey raggii gacanta kuu qaaday,
boqorow, sayidkaygiiyow. 29 Boqorkiina wuxuu yidhi, Ninkii
dhallintayaraa ee Absaaloom ahaa ma nabdoon yahay?
Axiimacasna wuxuu ku jawaabay, Boqorow, markii Yoo'aab i
soo diray, anigoo addoonkaaga ah, waxaan arkay buuq weyn
laakiinse wax alla wuxuu ahaa ma aqaan. 30 Markaasaa
boqorkii wuxuu yidhi, Bal gees u leexo, oo halkan istaag.
Markaasuu gees u leexday oo istaagay. 31 Markaasaa
kii reer Kuush yimid, oo yidhi, War baan kuu wadaa,
boqorow, sayidkaygiiyow, waayo, Rabbigu maantuu kaaga
soo aarguday kuwii kugu kacay oo dhan. 32 Markaasaa
boqorkii wuxuu kii reer Kuush ku yidhi, Ninkii dhallintayaraa
ee Absaaloom ahaa ma nabdoon yahay? Oo kii reer
Kuushna wuxuu ku jawaabay, Boqorow, sayidkaygiiyow,
cadaawayaashaada iyo intii inay wax ku yeelaan kuugu kacda
oo dhanba, Ilaah ha ka yeelo sida ninkaas dhallinyarada
ahu yahay. 33 Oo boqorkiina aad buu u naxay, oo wuxuu
kor ugu baxay qolkii iridda ka koreeyey, wuuna ooyay; oo
intuu sii socdayna, wuxuu lahaa, Wiilkaygii Absaaloomow,
wiilkaygiiyow, wiilkaygii Absaaloomow! Hooggaygee, waan
ku dhiman lahaa, Absaaloomow, wiilkaygiiyow, wiilkaygiiyow!

**19** Markaasaa Yoo'aab waxaa loo soo sheegay oo
lagu yidhi, Bal eeg, boqorkii wuu u ooyayaa oo u
barooranayaa Absaaloom. 2 Oo maalintaas guushii waxay
dadkii oo dhan ugu rogmatay baroor, waayo, maalintaas
waxaa dadku maqlay in la yidhi, Boqorkii wiilkiisii buu u
murugoonayaa. 3 Oo dadkiina maalintaas qarsoodi bay ku
soo galeen magaaladii, sidii dad ceebaysanu ay u dhuuntaan
markii ay dagaalka ka cararaan. 4 Markaasaa boqorkii
hagoogtay, oo cod weyn buu ku qayliyey oo yidhi, Wiilkaygii
Absaaloomow, Absaaloomow, wiilkaygiiyow, wiilkaygiiyow! 5
Markaasaa Yoo'aab boqorkii ugu yimid gurigiisii, oo ku yidhi,
Maanta waxaad ceebaysay wejiyadii addoommadaada oo
dhan, kuwaasoo maanta naftaada badbaadshay, iyo nafta
wiilashaada iyo gabdhahaaga, iyo nafta naagahaaga, iyo
nafta naagahaaga addoommaha ah; 6 oo weliba waxaad
jeceshahay kuwa ku neceb, kuwa ku jecelna waad neceb
tahay. Waayo, maanta waxaad caddaysay inaanay amiirro
iyo addoommoba waxba kula ahayn, maxaa yeelay, maanta
waxaan ogaaday, haddii Absaaloom noolaan lahaa, oo aan
annagu kulligayo dhiman lahayn, inaad taas aad ugu farxi
lahayd. 7 Haddaba saas daraaddeed kac, oo dibadda u
bax, oo addoommadaada intaad la hadashid dhiiro geli;
waayo, Rabbigaan ku dhaartaye, haddaadan dibadda u
bixin, inaan ninna caawa kula joogayn; oo taasuna way
kaaga sii xumaanaysaa kulli sharkii kugu dhacay tan iyo
yaraantaadii. 8 Markaasaa boqorkii sara joogsaday, oo iriddii
buu fadhiistay. Oo taasaa loo sheegay dadkii oo dhan, oo
lagu yidhi, Bal eega, boqorkii iridduu fadhiyaaye, markaasaa
dadkii oo dhammu boqorkii hor yimaadeen. Markii hore reer
binu Israa'iil nin waluba wuxuu u cararay teendhadiisii. 9
Oo dadkii oo dhan iyo qabiilooyinkii reer binu Israa'iil oo
dhammu way isla doodayeen, oo waxay islahaayeen, War
boqorku wuxuu inaga samatabbixiyey cadaawayaasheenna,
reer Falastiinna wuu inaga badbaadshay, oo haatanna
wuxuu dalka uga cararay Absaaloom aawadiis. 10 Oo
Absaaloomkii aynu u subkannay inuu inoo taliyana dagaalkii
buu ku dhintay. Haddaba maxaad uga hadli weydeen si
boqorka loo soo celiyo? 11 Markaasaa boqorkii u cid diray
wadaaddadii ahaa Saadooq iyo Aabyaataar, oo wuxuu ku
yidhi, Odayaasha dalka Yahuudah la hadla oo ku dhaha,
Waxaa boqorka u yimid hadalkii reer binu Israa'iil oo dhan oo
leh, Boqorka gurigiisa ha lagu soo celiyo, laakiinse maxaad
idinku dadka uga hadheen si aad boqorka gurigiisii ugu
soo celisaan? 12 War idinku walaalahay baad tihiin, oo
waxaad kaloo tihiin laftayda iyo luddayda; haddaba maxaad
idinku dadka uga hadheen si aad boqorka gurigiisii ugu
soo celisaan? 13 Oo Camaasaana waxaad ku tidhaahdaan,
War miyaadan ahayn laftayda iyo luddayda? Ilaah saas iyo
si ka sii daran ha igu sameeyo, haddaan ciidanka sirkaal
kaaga dhigi waayo, oo aadan had iyo goorba hortayda
joogin meeshii Yoo'aab! 14 Markaasuu soo jeediyey qalbigii
dadkii dalka Yahuudah oo dhan, oo wuxuu ka dhigay sidii
nin keliya qalbigiis; saas aawadeed waxay u soo cid direen
boqorkii, oo ku yidhaahdeen, Adiga iyo addoommadaada oo
dhammuba soo noqda. 15 Haddaba boqorkii wuu noqday,
oo wuxuu yimid Webi Urdun. Oo dadkii dalka Yahuudahna
waxay yimaadeen Gilgaal inay boqorka ka hor tagaan, oo
ay boqorka ka gudbiyaan Webi Urdun. 16 Oo Shimcii ina

Geeraa oo ahaa reer Benyaamiin oo ka yimid Baxuuriim
ayaa soo dhaqsaday oo ula soo dhaadhacay raggii reer
Yahuudah inay Boqor Daa'uud ka hor tagaan. **17** Oo waxaa
isaga la socday kun nin oo reer Benyaamiin ah, iyo Siibaa
oo ahaa midiidinkii reerkii Saa'uul, iyo shan iyo tobankiisii wiil
iyo labaatankiisii addoon; oo Webi Urdun bay dhex mareen
isagoo boqorku arko. **18** Markaasaa waxaa gudubtay sixiimad
in lagu soo tallaabiyo reer boqor iyo inuu sameeyo wixii isaga
la wanaagsan. Oo Shimcii oo ahaa ina Geeraa ayaa ku
dhacay boqorka hortiisii markuu Webi Urdun ka soo gudbay.
**19** Oo wuxuu boqorkii ku yidhi, Sayidkaygiiyow, dembi ha
igu tirin, oo ha xusuusan wixii aan anoo addoonkaaga ah
si qalloocan kuugu sameeyey maalintii aad Yeruusaalem
ka baxday, oo boqorow, sayidkaygiiyow, taas qalbiga ha
ku qabsan. **20** Waayo, anigoo addoonkaaga ah haatan
waan ogahay inaan dembaabay, oo sidaas daraaddeed
ayaan maanta reer Yuusuf oo dhan ugu soo hor maray
inaan soo dhaadhaco oo aan kaa hor imaado, boqorow,
sayidkaygiiyow. **21** Laakiinse waxaa u jawaabay Abiishay
oo ay Seruuyaah dhashay, oo wuxuu ku yidhi, Shimcii
miyuusan u dhimanayn waxan uu sameeyey, maxaa yeelay,
wuxuu habaaray Rabbiga kiisii subkanaa? **22** Markaasaa
Daa'uud wuxuu yidhi, Kuwiinna ay Seruuyaah dhashayow,
maxaa inaga dhexeeya? Oo maxaadse maanta cadaawayaal
iigu noqoteen? Maanta reer binu Israa'iil ma nin baa laga
dilayaa? Oo miyaanan anigu maanta ogayn inaan ahay
boqor reer binu Israa'iil u taliya? **23** Markaasaa boqorkii
wuxuu Shimcii ku yidhi, Adigu dhiman maysid. Boqorkiina
wuu u dhaartay. **24** Kolkaasaa waxaa yimid inuu boqorka ka
hor tago Mefiiboshed oo ahaa ina Saa'uul; oo kaasu maalintii
boqorku tegey iyo ilaa maalintii uu soo nabad noqday inta
ka dhex leh cagihiisa ma uu hagaajin, gadhkiisiina ma uu
jarin, dharkiisiina ma uu maydhin. **25** Markuu Yeruusaalem
u yimid inuu boqorka ka hor tago ayaa boqorkii ku yidhi,
Mefiiboshedow, maxaad ii raaci weyday? **26** Oo isna wuxuu ku
jawaabay, Boqorow, sayidkaygiiyow, waxaa i khiyaaneeyey
addoonkaygii, waayo, anoo addoonkaagii ah waxaan is-
idhi, Waxaan kooraysan dameer inaan fuulo aawadeed,
markaasaan boqorka raaci doonaa, waayo, curyaan baan
ahay. **27** Oo anigoo addoonkaagii ah ayuu igu kaa hor
xantay boqorow, sayidkaygiiyow, laakiinse waxaad tahay sidii
malaa'ig Ilaah oo kale; haddaba wixii kula wanaagsan samee.
**28** Waayo, reerka aabbahay oo dhammu waxay ahaayeen
sida dad dhintay oo kale xaggaaga boqorow, sayidkaygiiyow,
laakiinse anoo addoonkaaga ah waxaad i dhex fadhiisisay
kuwa wax ka cuna miiskaaga. Haddaba weli xaqee baan
u leeyahay inaan mar dambe kuu qayshado, boqorow?
**29** Boqorkiina wuxuu ku yidhi, War maxaad weli uga sii
hadlaysaa axwaalahaaga? Waxaan ku leeyahay, Adiga iyo
Siibaa dhulka qaybsada. **30** Markaasaa Mefiiboshed wuxuu
boqorkii ku yidhi, Isagu ha iska wada qaato, mar haddaad
gurigaaga ku soo nabad noqotay, boqorow, sayidkaygiiyow.
**31** Oo Barsillay oo ahaa reer Gilecaad ayaa Rogeliim ka
yimid; oo wuxuu boqorka kala gudbay Webi Urdun, si uu
u sii sagootiyo. **32** Barsillayna nin aad u da' weyn buu
ahaa, oo wuxuu jiray siddeetan sannadood, oo boqorkana
sooryuu u keeni jiray intuu Maxanayim joogay, maxaa
yeelay, nin aad u weyn buu ahaa. **33** Markaasaa boqorkii
wuxuu Barsillay ku yidhi, Kaalay oo ila gudub, oo anna
Yeruusaalem baan kugu quudin doonaa. **34** Barsillayna
wuxuu boqorkii ku yidhi, Bal cimrigaygu waa intee, markaan
boqorka Yeruusaalem u raacayo? **35** Maanta waxaan jiraa
siddeetan sannadood, haddaba miyaan kala garan karaa
xumaanta iyo samaanta? Oo anigoo addoonkaaga ah miyaan
dhadhamin karaa waxaan cuno iyo waxaan cabbo toona?
Oo miyaan in dambe maqli karaa codka ragga gabyaya
iyo dumarka heesaya? Haddaba anoo addoonkaaga ah
maxaan culays kuugu noqonayaa, boqorow, sayidkaygiiyow?
**36** Anoo addoonkaaga ah waxaan doonayay inaan Webi
Urdun kaala gudbo oo keliya; haddaba maxaad abaalgudkan
weyn iigu soo celinaysaa, boqorow? **37** Haddaba anoo
addoonkaaga ah, waan ku baryayaaye, i daa aan dib
u noqdee, si aan ugu dhinto magaaladaydii iyo meel u
dhow qabrigii aabbahay iyo hooyaday. Laakiinse bal eeg
addoonkaagii Kimhaam; isagu ha kula gudbo, boqorow,
sayidkaygiiyow, oo isaga ku samee wax alla wixii kula
wanaagsan. **38** Markaasaa boqorkii wuxuu ku jawaabay,
Kimhaam aniguu ila gudbayaa, oo waxaan u samaynayaa
wixii kula wanaagsan; oo wax alla wixii aad i weyddiisato,
waan kuu samaynayaa. **39** Oo dadkii oo dhammu Webi Urdun
bay ka gudbeen, oo boqorkiina wuu gudbay; boqorkiina
Barsillay wuu dhunkaday, wuuna u duceeyey; oo isna wuxuu
ku noqday meeshiisii. **40** Sidaasuu boqorkii ugu gudbay
Gilgaal, oo Kimhaamna isaguu la gudbay, oo reer Yahuudah
oo dhammuna boqorkii bay soo gudbiyeen, iyo reer binu
Israa'iil badhkood. **41** Dabadeedna dadkii reer binu Israa'iil
oo dhammu boqorkii bay u yimaadeen, oo waxay boqorkii
ku yidhaahdeen, Walaalaheen oo ah ragga reer Yahuudah
maxay kuu xadeen, oo ay adiga iyo reerkaagaba Webi
Urdun idiinku tallaabiyeen iyo weliba raggaagii kula jirayba,
boqorow? **42** Markaasaa raggii reer Yahuudah waxay ugu
jawaabeen raggii reer binu Israa'iil, War boqorku annaguu
na hilib xigaa, ee maxaad xaaladdan ugu cadhoonaysaan?
War ma annagaa boqorka wax ka cunnay? Mase hadiyad

buu na siiyey? 43 Oo raggii reer binu Israa'iilna waxay raggii
reer Yahuudah ugu jawaabeen, War boqorka toban meelood
baannu ku leennahay, oo weliba Daa'uud annagaa idinkaga
xaq leh, haddaba maxaad noo quudhsateen oo aad hore
noo weyddiin weydeen talo ku saabsan boqorkeenna soo
celintiisa? Oo raggii reer Yahuudah erayadoodii way ka sii
adkaayeen erayadii raggii reer binu Israa'iil.

20 Oo halkaasna waxaa joogay nin waxmatare ah, oo
magiciisa la odhan jiray Shebac, oo ahaa ina Bikrii, oo
qoladiisu ahayd reer Benyaamiin, oo buunkii buu afuufay,
oo yidhi, Annagu Daa'uud qayb kuma lihin, dhaxalna kuma
lihin ina Yesay, haddaba reer binu Israa'iilow, nin walowba
teendhadaadii tag. 2 Sidaas daraaddeed raggii reer binu
Israa'iil oo dhammu way ka hadheen Daa'uud la socodkiisii,
oo waxay daba galeen Shebac oo ahaa ina Bikrii, laakiinse
raggii reer Yahuudah waxay ku hadheen boqorkoodii, oo
ay la socdeen tan iyo Webi Urdun xataa ilaa Yeruusaalem.
3 Daa'uudna waa yimid gurigiisii Yeruusaalem ku yiil,
markaasaa boqorkii soo kaxaystay tobankiisii naagood oo
addoommaha ahaa, ee uu kaga tegey inay guriga dhawraan,
oo intuu meel gaadh leh geliyey ayuu masruufayay, laakiinse
uma uu tegin. Sidaas daraaddeed ilamaa maalintii ay
dhinteen bay xidhnaayeen, iyagoo carmallo ah. 4 Markaasaa
boqorkii wuxuu Camaasaa ku yidhi, Ragga reer Yahuudah
muddo saddex maalmood ah isugu kay yeedh, oo adiguna
markaas halkan joog. 5 Markaasaa Camaasaa u tegey
inuu reer Yahuudah isugu yeedho, laakiinse wuu ka daba
maray wakhtigii loo qabtay ee lala ballamay. 6 Markaasaa
Daa'uud Abiishay ku yidhi, Hadda Shebac oo ah ina Bikrii
wuxuu inagu samayn doonaa waxyeello ka sii daran tii
Absaaloom, haddaba addoommada sayidkaaga kexee, oo
eryo, waaba intaasoo ay magaalo deyr leh helaan, oo
ay inaga baxsadaane. 7 Markaasaa waxaa isagii raacay
Yoo'aab raggiisii, iyo reer Kereetiim iyo reer Feleetii, iyo
raggii xoogga lahaa oo dhan, oo Yeruusaalem bay uga
baxeen inay eryadaan Shebac ina Bikrii. 8 Oo markay
gaadheen dhagaxii weynaa oo Gibecoon ku yiil ayaa waxaa
ka hor yimid Camaasaa. Oo Yoo'aabna wuxuu guntanaa
dharkiisii dagaalka ee uu xidhay, oo wuxuu kaloo ka kor
dhex-xidhay seef gal lihi ku xidhnayd, oo markuu horay u soo
baxay ayay ka dhacday. 9 Markaasaa Yoo'aab Camaasaa ku
yidhi, Walaalkayow, ma nabdoon tahay? Yoo'aabna gacanta
midig ayuu Camaasaa gadhka ku qabtay inuu dhunkado.
10 Laakiinse Camaasaa iskama uu jirin seefta Yoo'aab
gacanta ugu jirtay, sidaasuu caloosha seeftii ugaga dhuftay,
oo xiidmihiisiina dhulkuu ugu soo daadiyey, oo mar kalena
kuma uu dhufan; wuuna dhintay. Dabadeedna Yoo'aab iyo
walaalkiis Abiishay waxay eryadeen Shebac oo ahaa ina
Bikrii. 11 Markaasaa waxaa ag istaagay mid ka mid ah
Yoo'aab raggiisii dhallinyarada ahaa, oo wuxuu yidhi, Kii
Yoo'aab jecel iyo kii Daa'uud la dhinac ahu Yoo'aab ha
raaceen. 12 Oo Camaasaa wuxuu yiil jidka dhexdiisa isagoo
dhiiggiisii dhex jiifa. Oo ninkiina markuu arkay in dadkii oo
dhammu weli taagan yihiin ayuu Camaasaa jidkii ka qaaday
oo meel ku jiiday, markaasuu marona kor saaray kolkuu
arkay in dadkii yimid oo dhammu ay is-ag taageen. 13 Oo
markii jidka laga durkiyey ayaa dadkii oo dhammu tageen
oo Yoo'aab raaceen inay eryadaan Shebac oo ahaa ina
Bikrii. 14 Isna wuxuu dhex maray qabiilooyinkii reer binu
Israa'iil oo dhan iyo tan iyo Aabeel, iyo Beytmacakaah, iyo
reer Beerii oo dhan, oo dhammaantood intay soo urureen
ayay eryadeen. 15 Oo intay yimaadeen ayay isagii ku
hareereeyeen Aabeel oo ku taal Beytmacakaah, oo taallo
ciid ah ayay derbigii magaalada ag tuuleen, ilaa ay qarkii
ugu sarreeyey gaadhsiiyeen; oo dadkii Yoo'aab la socday oo
dhammuna aad bay u garaacayeen derbigii magaalada si ay
u dumiyaan. 16 Markaasaa naag caqli badanu magaaladii
ka dhawaaqday, oo waxay tidhi, Waan idin baryayaaye, I
maqla, oo i dhegaysta; oo waxaad Yoo'aab ku tidhaahdaan,
Halkan iigu kaalay, aan kula hadlee. 17 Markaasuu u
soo dhowaaday, oo naagtii waxay ku tidhi, Ma Yoo'aab
baad tahay? Oo isna wuxuu ugu jawaabay, Haah, waan
ahay. Kolkaasay ku tidhi, Bal erayadayda maqal, anoo
addoontaada ah, oo isna wuxuu ugu jawaabay, Waan ku
maqlayaa. 18 Markaasay la hadashay oo ku tidhi, Waxaa
waa hore la odhan jiray, Hubaal Aabeel talo ha laga doonto,
oo saasay xaalkii ku dhammeeyeen. 19 Anigu waxaan ka mid
ahay kuwa reer binu Israa'iil ee nabadda jecel ee aaminka
ah, adiguse waxaad doonaysaa inaad dumiso magaalo
iyo hooyo reer binu Israa'iil ah. Rabbiga dhaxalkiisase
maxaad u liqaysaa? 20 Markaasaa Yoo'aab wuxuu ugu
jawaabay, Inaan wax liqo oo dumiyo ha iga fogaato, oo ha
iga dheeraato. 21 Laakiinse xaaladdu saas ma aha. Nin ka
yimid dalka buuraha leh oo reer Efrayim, oo magiciisa la
yidhaahdo Shebac ina Bikrii ayaa gacanta u qaaday boqorka
Daa'uud ah. Haddaba isaga keliya ii soo gacangeliya, oo
anna magaalada waan ka tegayaa. Markaasaa naagtii waxay
Yoo'aab ku tidhi, Bal eeg, madaxiisii ayaa derbiga lagaaga
soo tuurayaa. 22 Markaasaa naagtii waxay caqligeedii ula
tagtay dadkii oo dhan. Shebac oo ina Bikrii ahaana intay
madaxii ka soo gooyeen ayay Yoo'aab dibadda ugu soo
tuureen. Markaasuu buunkii afuufay, oo ay magaaladii ka
kala dareereen, oo nin waluba wuxuu tegey teendhadiisii.

Oo Yoo'aabna Yeruusaalem iyo boqorkii buu ku noqday. **23**
Haddaba Yoo'aab wuxuu u sarreeyey ciidanka reer binu
Israa'iil oo dhan; Benaayaah oo ahaa ina Yehooyaadaacna
wuxuu u sarreeyey reer Kereetiim iyo reer Feleetii. **24** Oo
Adoraamna wuxuu ahaa kan baad qaada, Yehooshaafaad
oo ahaa ina Axiiluudna wuxuu ahaa kan taariikhda dhiga, **25**
oo Shewaana karraani buu ahaa, Saadooq iyo Aabyaataarna
wadaaddo bay ahaayeen, **26** oo Ciiraa oo reer Yaa'iir ahaa
isna Daa'uud buu wadaad u ahaa.

**21** Oo wakhtigii Daa'uud abaar baa dhacday intii saddex
sannadood ah, oo sannadba sannadda ka dambayso,
markaasaa Daa'uud Rabbiga baryay. Rabbiguna wuxuu
yidhi, Tanu waxay ku timid Saa'uul iyo reerkiisa dhiigga qaba,
maxaa yeelay, wuxuu laayay reer Gibecoon. **2** Markaasaa
boqorkii reer Gibecoon u yeedhay, oo ku yidhi; (haddaba
reer Gibecoon ma ay ahayn reer binu Israa'iil, laakiinse
waxay ahaayeen dad ka hadhay reer Amor; oo reer binu
Israa'iilna way u dhaarteen iyaga; oo Saa'uul baa wuxuu
damcay inuu laayo iyaga qiiradii uu u qabay reer binu
Israa'iil iyo reer Yahuudah aawadeed; ) **3** oo Daa'uud wuxuu
reer Gibecoon ku yidhi, War maxaan idiin sameeyaa? Oo
maxaan kafaaraggud u bixiyaa si aad dhaxalka Rabbiga ugu
ducaysaan? **4** Oo reer Gibecoonna waxay ku yidhaahdeen,
Annaga iyo Saa'uul, iyo reerkiisa waxa na dhex yaallaa ma
aha xaal ku eg lacag iyo dahab; oo annana dooni mayno
inaannu reer binu Israa'iil nin ka dilno. Markaasuu ku yidhi,
Haddaba wixii aad tidhaahdaan waan idiin samaynayaa. **5**
Iyana waxay boqorkii ku yidhaahdeen, Ninkii na baabbi'iyey,
oo ku fikiray in nala laayo, oo aannan dhex degganaan
waddanka reer binu Israa'iil oo dhan, **6** ha naloo keeno
toddoba nin oo wiilashiisii ah, oo Rabbiga ayaannu ugu
deldelaynaa Gibecaahdii Saa'uul, kii Rabbigu doortay. **7**
Laakiinse boqorkii wuu badbaadiyey Mefiiboshed, oo ahaa
ina Yoonaataan ina Saa'uul, maxaa yeelay, dhaartii Rabbiga
ayaa u dhexaysay Daa'uud iyo Yoonaataan ina Saa'uul. **8**
Laakiinse boqorkii wuxuu soo qabtay labadii wiil ee Risfaah
ina Ayah, oo ay u dhashay Saa'uul, kuwaas oo ahaa Armonii
iyo Mefiiboshed, iyo shantii wiil ee Miikaal ina Saa'uul, oo
ay u dhashay Cadrii'eel ina Barsillay kii reer Mexolaad; **9**
oo wuxuu u gacangeliyey reer Gibecoon, oo buurtay ku
deldeleen Rabbiga hortiisa, oo toddobadoodiiba way wada
dhinteen; oo waxaana la dilay xilligii beergooyska maalmaha
ugu horreeya, marka shaciirka la gooyo. **10** Markaasaa
Risfaah oo ahayd ina Ayah ayaa soo qaadatay dhar joonyad
ah oo waxay ku goglatay dhagaxa, halkaasna waxay joogtay
wakhtigii beergooyska iyo ilaa roob cirka ka soo daatay; oo
maalintiina uma ay oggolaan in haadka hawadu ku dego,
habeenkiina waxay ka dhawri jirtay dugaagga duurka. **11** Oo
waxaa Daa'uud loo soo sheegay wixii ay samaysay Risfaah
ina Ayah oo ahayd Saa'uul naagtiisii addoonta ahayd. **12** Oo
Daa'uud intuu tegey ayuu lafihii Saa'uul iyo lafihii wiilkiisii
Yoonaataan ka soo qaaday dadkii reer Yaabeesh Gilecaad
oo ka xaday jidkii Beytshaan, kaasoo ah meeshii ay reer
Falastiin ku deldeleen iyaga, maalintii ay reer Falastiin
Saa'uul ku dileen Gilboca, **13** oo halkaasuu ka soo qaaday
lafihii Saa'uul iyo lafihii wiilkiisii Yoonaataan; oo waxaa la soo
ururiyey kuwii la deldelay lafahoodii. **14** Oo lafihii Saa'uul
iyo lafihii wiilkiisii Yoonaataan waxaa lagu aasay dalka reer
Benyaamiin meel ku taal oo la yidhaahdo Seelac, oo waxaa
la geliyey qabrigii aabbihiis Qiish; oo waxaa la sameeyey
kulli wixii boqorku ku amray oo dhan. Oo taas dabadeedna
Ilaah baa dalkii loo baryay. **15** Oo haddana reer Falastiin
waxay la dirireen reer binu Israa'iil, markaasaa Daa'uud
dhaadhacay isaga iyo addoommadiisii la socdayba, oo
waxay la dirireen reer Falastiin; laakiinse Daa'uud wuu taag
gabay. **16** Oo Yiishbii Benob, oo ka mid ahaa wiilashii Rafaa,
oo miisaanka warankiisu ahaa saddex boqol oo sheqel oo
naxaas ah, oo seef cusubuna dhexday ugu xidhnayd, ayaa
damcay inuu Daa'uud dilo. **17** Laakiinse Daa'uud waxaa
caawiyey Abiishay oo ay Seruuyaah dhashay, oo intuu kii
reer Falastiin wax ku dhuftay ayuu dilay. Markaasaa Daa'uud
raggiisii dhaar u mareen, oo ku yidhaahdeen, Adigu mar
dambe dagaal noola bixi maysid, yaadan laambadda reer
binu Israa'iil bakhtiine. **18** Oo taas dabadeed waxay noqotay
in reer Falastiin haddana Goob lagula diriray, oo Sibbekay
oo reer Xushaad ahaa wuxuu dilay Saf oo ahaa mid ka mid
ah wiilashii Rafaa. **19** Oo haddana reer Falastiin waxaa
lagula diriray Goob; oo Elxaanaan ina Yacaray Oregiim oo
reer Beytlaxam ahaa wuxuu dilay Goli'ad oo reer Gad ahaa,
oo samayda warankiisuna waxay le'ekayd dharsameeyaha
looxiisa. **20** Oo haddana waxaa dagaal ka dhacay Gad,
halkaasna waxaa joogay nin aad u dheer, oo gacmahana
mid kasta wuxuu ku lahaa lix farood, cagahana mid kasta
wuxuu ku lahaa lix farood, oo farihiisuna kulligood waxay
ahaayeen afar iyo labaatan, oo isna wuxuu u dhashay Rafaa.
**21** Oo markuu reer binu Israa'iil caayay, waxaa isagii dilay
Yoonaataan oo uu Daa'uud walaalkiisii Shimcii ahaa dhalay.
**22** Afartaasu waxay Rafaa ugu dhasheen Gad; oo waxay ku
dhinteen Daa'uud gacantiisii, iyo gacantii addoommadiisa.

**22** Daa'uud wuxuu Rabbiga kula hadlay erayadii
gabaygan maalintii Rabbigu ka samatabbixiyey gacantii
cadaawayaashiisa oo dhan, iyo gacantii Saa'uulba: **2** oo
wuxuu yidhi, Rabbigu waa dhagax weyn oo ii gabbaad ah,
iyo qalcaddayda iyo samatabbixiyahayga, xataa waa kayga;

3 Iyo Ilaaha ah gabbaadkayga, isagaan isku hallayn doonaa;
Isagu waa gaashaankayga, iyo geeska badbaadadayda,
iyo munaaraddayda dheer, iyo magangalkayga, Iyo
badbaadshahayga, waxaad iga badbaadisaa dulmiga. 4
Waxaan baryayaa Rabbiga istaahila in la ammaano, Oo
sidaasaan cadaawayaashayda kaga badbaadi doonaa.
5 Waayo, waxaa i hareereeyey hirarkii dhimashada, Oo
waxaa i cabsiiyey daadkii cibaadola'aanta. 6 Waxaa igu
wareegsanaa xadhkihii She'ool; Oo waxaa i qabsaday
dabinnadii dhimashada. **(Sheol h7585)** 7 Anigoo cidhiidhi ku
jira ayaan Rabbiga baryay, Haah, waxaan u qayshaday
Ilaahay; Oo isna codkayguu macbudkiisa ka maqlay, Oo
qayladayduna dhegihiisay gashay. 8 Markaasaa dhulku
ruxmay oo gariiray, Oo samada aasaaskeediina wuu
dhaqdhaqaaqay, Oo wuu ruxmay, maxaa yeelay, Ilaah waa
cadhaysnaa. 9 Oo dulalka sankiisa waxaa ka soo baxay
qiiq, Afkiisana waxaa ka soo baxay dab wax gubaya; Oo
dhuxulaa ka shidmay isaga. 10 Oo samooyinkiina wuu
soo foororshay, oo hoos buu u soo degay, Oo cagihiisana
waxaa hoos yiil gudcur weyn. 11 Wuxuuna fuulay Keruub,
wuuna duulay; Haah, oo waxaa lagu arkay isagoo fuushan
dabaysha baalasheeda. 12 Oo gudcurkii wuxuu ka dhigay
taambuug hareerihiisa ku wareegsan, Iyo biyo urursan,
iyo daruuraha qarada waaweyn oo cirka. 13 Oo nuurka
hortiisa yaal aawadiisna Dhuxulo dab ah ayaa shidmay. 14
Rabbiguna wuxuu ka onkoday samada, Sarreeyuhuna wuxuu
ku hadlay codkiisii. 15 Markaasuu fallaadho soo ganay, oo
kala firdhiyey iyagii, Oo wuxuu soo diray hillaac, wuuna
baabbi'iyey iyagii. 16 Oo canaantii Rabbiga aawadeed, iyo
dulalka sankiisa neefta ka soo baxaysa aawadeed Ayaa
durdurradii baddu la muuqdeen, Oo aasaaskii duniduna wuu
soo bannaan baxay. 17 Xagga sare ayuu cid ka soo diray, oo
wuu i qaaday; Oo wuxuu iga soo dhex bixiyey biyo badan. 18
Wuxuu iga samatabbixiyey cadowgaygii xoogga badnaa, Iyo
kuwii i necbaaba; waayo, iyagu way iga xoog badnaayeen.
19 Waxay igu soo kediyeen maalintii aan belaayaysnaa;
Laakiinse Rabbigu wuxuu ii ahaa tiir. 20 Weliba wuxuu i
keenay meel ballaadhan; Wuu i samatabbixiyey, maxaa
yeelay, wuu igu farxay. 21 Rabbigu wuxuu iigu abaalguday
sidii ay xaqnimadaydii ahayd; Oo sida ay nadiifsanaantii
gacmahaygu ahayd ayuu iigu abaalguday. 22 Waayo, anigu
waan xajiyey jidadkii Rabbiga, Oo Ilaahayna sii caasinimo
ah ugama tegin. 23 Waayo, xukummadiisii oo dhammu
hortayday yiilleen, Oo qaynuunnadiisana anigu kama aan
tegin. 24 Oo weliba xaggiisana waan ku qummanaa, Oo
waan iska dhawray xumaantaydii. 25 Sidaas daraaddeed
ayaa Rabbigu iigu abaalguday sidii ay xaqnimadaydii
ahayd; Iyo sidii nadiifsanaantaydii ay ku ahayd indhihiisa
hortooda. 26 Kii naxariis leh waad u naxariisanaysaa, Oo
ninkii qummanna waad u qummanaanaysaa. 27 Kii daahir
ahna daahir baad u ahaanaysaa. Oo kii qalloocanna mid
maroorsan baad u ahaanaysaa. 28 Oo dadka dhibaataysanna
waad badbaadinaysaa; Laakiinse indhahaagu way arkaan
kuwa kibirsan inaad hoos u dejiso. 29 Waayo, Rabbiyow,
waxaad tahay laambaddayda; Oo Rabbiga ayaa gudcurkayga
iftiiminaya. 30 Oo adaan col kuugu dhex ordaa, Oo Ilaahay
caawimaaddiisa ayaan derbi kaga boodaa. 31 Ilaah jidkiisu
waa qumman yahay; Rabbiga eraygiisuna waa mid la
tijaabiyey; Oo isagu wuxuu gaashaan u yahay kuwa isku
halleeya oo dhan. 32 Bal yaa Ilaah ah, Rabbiga mooyaane?
Oo bal yaa dhagax weyn ah, Ilaahayaga mooyaane? 33
Ilaah waa qalcaddayda xoogga badan; Oo isagu wuxuu
hoggaamiyaa kuwa jidkiisa ku qumman. 34 Isagu cagahayga
wuxuu ka dhigaa sida cagaha deerada, Oo wuxuu igu
fadhiisiyaa meelahayga sarsare. 35 Gacmahaygana wuxuu
baraa dagaalka; Oo sidaas daraaddeed gacmahaygu waxay
xoodaan qaanso naxaas ah. 36 Weliba waxaad kaloo
i siisay gaashaankii badbaadadaada; Oo roonaantaada
ayaa i weynaysay; 37 Adigu tallaabooyinkayga ayaad
ku ballaadhisay hoostayda, Oo cagahayguna ma ay
simbiriirixan. 38 Anigu waxaan eryaday cadaawayaashaydii,
oo waan baabbi'iyey; Dibna ugama soo noqon jeeray wada
baabbe'een. 39 Oo iyagaan baabbi'iyey, waanan wada
laayay, si aanay mar dambe u awoodin inay soo sara kacaan,
Oo cagahaygay ku soo hoos dhaceen. 40 Waayo, xoog
baad iigu guntisay dagaalka aawadiis; Oo kuwii igu kacayna
hoostaydaad ku soo tuurtay. 41 Oo cadaawayaashaydiina
waxaad ka dhigtay inay dhabarka ii jeediyaan, Si aan u
kala gooyo kuwa i neceb. 42 Wax bay fiirsadeen, laakiinse
way waayeen mid iyaga badbaadiya; Oo xataa Rabbiga
way baryeen, laakiinse uma uu jawaabin. 43 Markaasaan
iyagii u duqeeyey sida boodhka dhulka, Waan ku tuntay sidii
dhoobada jidadka taal oo kale, markaasaan kala firdhiyey.
44 Oo waxaad kaloo iga samatabbixisay murankii dadkayga;
Oo waxaad iga sii dhigtay quruumaha madaxdoodii; Oo dad
aanan aqoon ayaa ii adeegi doona. 45 Oo shisheeyayaashu
way isu kay dhiibi doonaan, Oo mar alla markay warkayga
maqlaan way i addeeci doonaan. 46 Shisheeyayaashu way
libdhi doonaan, Oo iyagoo gariiraya ayay qolalkooda ka soo
bixi doonaan. 47 Rabbigu waa nool yahay; oo mahad waxaa
leh dhagaxayga weyn; Oo ha sarreeyo Ilaaha ah dhagaxa
weyn ee badbaadintayda; 48 Kaasoo ah Ilaaha aniga ii
aarguda, Oo dadkana hoostayda ku soo tuura, 49 Oo wuxuu
iga soo bixiyaa cadaawayaashayda; Haah, waxaad iga sara

marisaa kuwa igu kaca; Oo waxaad iga samatabbixisaa ninka
dulmiga badan. 50 Sidaas daraaddeed, Rabbiyow, anigu
waxaan kuugu mahadnaqi doonaa quruumaha dhexdooda,
Oo magacaaga ammaan baan ugu gabyi doonaa. 51 Rabbigu
si weyn buu boqorkiisa u samatabbixiyaa, Oo wuxuu weligiis
raxmad u sameeyaa kii uu subkaday, Kaasoo ah Daa'uud
iyo farcankiisaba weligiis iyo weligiis.

23 Haddaba erayadanu waa kuwii ugu dambeeyey oo
Daa'uud. Daa'uud ina Yesay wuxuu leeyahay, Ninkii kor
loo qaadayna wuxuu leeyahay, Kaasoo ah kii Ilaaha Yacquub
subkay, Ee ugu sabuur macaan reer binu Israa'iil oo dhan:
2 Rabbiga ruuxiisii baa iga dhex hadlay, Oo eraygiisiina
carrabkayguu saarnaa. 3 Ilaaha reer binu Israa'iil baa yidhi,
Oo Dhagaxii weynaa ee reer binu Israa'iil ayaa ila hadlay,
isagoo leh, Waxaa jiri doona mid dadka si xaq ah ugu taliya,
Oo Ilaah cabsidiisa wax ku xukuma, 4 Kaasu wuxuu ahaan
doonaa sida iftiinka subaxdii, marka qorraxdu soo baxdo, Iyo
sida aroor aan cadar ahayn; Markuu doog jilicsanu dhulka ka
soo baxo, Oo uu bayaan u dhalaalayo roobka dabadiis. 5 Sida
runta ah reerkaygu xagga Ilaah saas kuma aha; Laakiinse
axdi aan weligiis dhammaanayn ayuu ila dhigtay, Oo wax
kastaba wuu hagaajiyey, wuuna adkeeyey; Oo in kastoo
uusan soo bixin weliba waa badbaadadayda oo dhan iyo
doonistayda oo dhanba. 6 Laakiinse kuwa waxmatarayaasha
ah dhammaantood waxay noqonayaan sidii qodxanta layska
tuuro, Waayo, iyaga gacanta laguma qaadi karo; 7 Laakiinse
ninkii iyaga taabta Waa in hub looga dhigaa bir iyo waran
samaydiisa; Oo iyana dhammaantood meeshoodaa lagu
gubi doonaa. 8 Kuwanu waa magacyadii nimankii xoogga
badnaa oo Daa'uud haystay: Yoshebbashebed oo ahaa reer
Taxkemon, oo saraakiisha madax u ahaa, kaasoo ahaa
Cadiinoo kii reer Cesen, oo warankiisa u qaaday siddeedda
boqol oo isku mar qudha dilay. 9 Oo kaas dabadiisna
waxaa jiray Elecaasaar ina Dooday, oo ahaa reer Axoo'ax,
oo kaasu wuxuu ahaa saddexdii nin oo Daa'uud la jirtay
midkood, markay caayeen reer Falastiin oo halkaas isugu
urursaday inay la diriraan, oo ay dadkii reer binu Israa'iilna
mar hore sii tageen. 10 Wuu kacay, oo laayay reer Falastiin
ilaa ay gacantii daashay, oo gacantii seeftii ku dhegtay; oo
Rabbiguna maalintaas aad buu u guuleeyey, markaasaa
dadkiina u soo noqdeen inay wax dhacaan oo keliya. 11
Oo isaga dabadiisna waxaa jiray Shammaah oo ahaa ina
Agee oo qoladiisuna ahayd reer Haraarii. Oo reer Falastiinna
waxay isu soo wada urursadeen inay soo dhacaan meel
misir ka buuxo, oo dadkiina waxay ka carareen reer Falastiin.
12 Laakiinse isagu beertuu isdhex taagay oo daafacay,
wuuna laayay reer Falastiin; oo Rabbiguna aad buu u
guuleeyey. 13 Oo soddonkii madaxda ahaa saddex ka mid
ah ayaa tegey, oo Daa'uud ugu yimid godkii Cadullaam xilligii
beergooyska; oo colkii reer Falastiinna waxay soo degeen
dooxadii Refaa'iim. 14 Oo markaas Daa'uud wuxuu ku jiray
dhufayska, oo ciidankii reer Falastiin xeradooduna waxay
ahayd Beytlaxam. 15 Oo Daa'uud intuu biyo u xiisooday
ayuu yidhi, Waxaan jeclaan lahaa in biyo layga siiyo ceelka
Beytlaxam ee iridda ku ag yaal! 16 Markaasaa saddexdii nin
ee xoogga badnaa ayaa dhex maray ciidankii reer Falastiin,
oo waxay biyo ka soo dhaamiyeen ceelkii Beytlaxam ee
iridda ku ag yiil, oo intay soo qaadeen ayay Daa'uud u
keeneen, laakiinse wuu diiday inuu ka cabbo biyahaas,
Rabbiguuse u daadshay. 17 Oo wuxuu yidhi, Rabbiyow, Ha
iga fogaato inaan saas yeelo; ma waxaan cabbaa dhiiggii
raggii naftooda biimeeyey? Sidaas daraaddeed wuu diiday
inuu cabbo. Oo saddexdii nin oo xoogga badnaana saasay
yeeleen. 18 Oo saddexdoodana waxaa madax u ahaa
Abiishay oo ahaa Yoo'aab walaalkiis, oo ay Seruuyaah
dhashay. Oo kaasu wuxuu waran u qaatay saddex boqol
oo nin, wuuna wada laayay, saddexdiina magac buu ku
lahaa. 19 Isagu miyaanu saddexdooda ugu ciso badnayn?
Sidaas daraaddeed waxaa looga dhigay sirkaal, habase
yeeshee saddexdii hore ma uu gaadhin. 20 Oo Benaayaah
ina Yehooyaadaac, oo uu dhalay nin xoog weyn oo reer
Qabse'eel ahu, kaasoo sameeyey falimo waaweyn, wuxuu
dilay labadii wiil oo Arii'eel kii reer Moo'aab, oo haddana wuu
tegey oo libaax buu god ku dhex dilay wakhtiga barafka, 21
oo wuxuu kaloo dilay nin Masri ah oo dheer, oo Masriguna
wuxuu gacanta ku haystay waran, laakiinse isagu wuxuu ula
tegey ul, oo warankii ka dhufsaday gacantii Masriga, oo isagii
ku dilay warankiisii. 22 Oo waxyaalahan waxaa sameeyey
Benaayaah ina Yehooyaadaac, oo isna saddexdii nin ee
xoogga badnaa magac buu ku lahaa. 23 Oo weliba isagu
wuu ka ciso badnaa soddonka, laakiinse ma uu gaadhin
saddexdii hore. Oo Daa'uudna wuxuu isaga madax uga
dhigay lataliyayaashiisii. 24 Oo soddonka waxaa ka mid ahaa
Casaaheel oo Yoo'aab walaalkiis ahaa, iyo Elxaanaan oo
ahaa ina Doodoo oo reer Beytlaxam ahaa, 25 iyo Shammaah
oo ahaa reer Xarod, iyo Eliiqaa oo ahaa reer Xarod, 26 iyo
Xeles oo ahaa reer Faltii, iyo Ciiraa ina Ciqeesh oo ahaa
reer Teqooca, 27 iyo Abiiceser oo ahaa reer Canaatood,
iyo Mebunnay oo ahaa reer Xushaad; 28 iyo Salmoon oo
ahaa reer Axoo'ax, iyo Maharay oo ahaa reer Netofaah, 29
iyo Xeeleb ina Bacanaah oo ahaa reer Netofaah, iyo Itay
ina Riibay oo ahaa reer Gibecaah oo qoladiisu ahayd reer
Benyaamiin; 30 iyo Benaayaah oo ahaa reer Fircaatoon, iyo

Xidday oo ka yimid durdurradii Gacash; **31** iyo Abiicalboon
oo ahaa reer Caraabaah, iyo Casmaawed oo ahaa reer
Barxum; **32** iyo Elyaxbaa oo ahaa reer Shacalbiim, iyo
wiilashii Yaasheen, Yoonaataan, **33** iyo Shammaah oo ahaa
reer Haraarii, iyo Axiyaam ina Shaaraar oo ahaa reer Araarii;
**34** iyo Eliifeled ina Axasbay, oo ahaa wiilkii kii reer Macakaah,
iyo Eliicaam ina Axiitofel oo ahaa reer Giloh; **35** iyo Xesroo
oo ahaa reer Karmel, iyo Facaray oo ahaa reer Araab; **36**
iyo Yigaal ina Naataan oo ahaa reer Soobaah, iyo Baanii
oo ahaa reer Gaad; **37** iyo Seleq oo ahaa reer Cammoon,
iyo Naxaray oo ahaa reer Bi'irod, iyo kuwii gaashaanka
u qaadi jiray Yoo'aab oo ay Seruuyaah dhashay; **38** iyo
Ciiraa oo ahaa reer Yeter, iyo Gaareeb oo ahaa reer Yeter,
**39** iyo Uuriyaah oo ahaa reer Xeed; oo kulligoodna waxay
ahaayeen toddoba iyo soddon.

**24** Oo haddana Rabbiga cadhadiisii aad bay ugu kululaatay
reer binu Israa'iil, oo Daa'uud buu iyagii ku soo
kiciyey, oo wuxuu yidhi, Tag oo soo tiri reer Israa'iil iyo
reer Yahuudah. **2** Markaasaa boqorkii ku yidhi Yoo'aab oo
ahaa sirkaalkii ciidanka oo isaga la joogay, Horay iyo dib
u dhex mar qabiilooyinka reer binu Israa'iil oo dhan, tan
iyo Daan iyo ilaa Bi'ir Shebac, oo dadka soo tiriya si aan
u ogaado dadka tiradiisa. **3** Markaasaa Yoo'aab boqorkii
ku yidhi, Rabbiga Ilaahaaga ahu ha badiyo dadka, oo in
kastoo ay yihiinba, ha ku daro boqol jibbaar, oo indhahaagu,
boqorow, sayidkaygiiyow, taas ha arkeen; laakiinse maxaad
taas ugu farxaysaa, boqorow, sayidkaygiiyow? **4** Habase
yeeshee boqorka hadalkiisii waa ka adkaaday hadalladii
Yoo'aab iyo saraakiishii ciidankaba. Markaasaa Yoo'aab
iyo saraakiishii ciidankuba boqorka hortiisii ka tageen inay
dadkii soo tiriyaan. **5** Oo waxay ka gudbeen Webi Urdun, oo
degeen Carooceer, oo ku taal xagga midigta oo magaalada
ku dhex taal dooxadii Gaad, iyo tan iyo Yacser, **6** oo haddana
waxay yimaadeen Gilecaad, iyo ilaa dalkii Taxtiim Xodshii; oo
waxay yimaadeen Daan Yacan, iyo Siidoon hareeraheeda, **7**
oo waxay yimaadeen dhufayskii Turos, iyo magaalooyinkii
reer Xiwi iyo reer Kancaan oo dhan; oo waxay tageen
xagga koonfureed oo dalka Yahuudah ilaa Bi'ir Shebac.
**8** Haddaba markay dalkii oo dhan horay iyo dib u dhex
mareen ayay Yeruusaalem ku soo noqdeen sagaal bilood
iyo labaatan maalmood dabadood. **9** Markaasaa Yoo'aab
boqorkii siiyey tiradii dadka; oo waxaa dalka Israa'iil ku jiray
siddeed boqol oo kun oo nin oo seefqaad ah oo xoog leh; oo
waxaa dalka Yahuudahna ku jiray shan boqol oo kun oo
nin. **10** Oo Daa'uudna qalbigiisii ayaa naxay markuu dadka
tiriyey dabadeed. Markaasaa Daa'uud Rabbiga ku yidhi,
Waxaan sameeyey aad baan ugu dembaabay; haddaba
Rabbiyow, waan ku baryayaaye, iga fogee dembigayga anoo
addoonkaaga ah, waayo, nacasnimo weyn baan sameeyey.
**11** Oo markii Daa'uud subixii toosay ayaa eraygii Rabbigu u
yimid Nebi Gaad, oo ahaa Daa'uud wax arkihiisa, oo wuxuu
yidhi, **12** Tag oo Daa'uud la hadal oo waxaad ku tidhaahdaa,
Rabbigu wuxuu kugu leeyahay, Saddexdan waxyaalood
baan ku siinayaa, ee ka dooro mid aan kugu sameeyo. **13**
Sidaas daraaddeed Gaad baa Daa'uud u yimid, oo intuu
u warramay ayuu ku yidhi, Toddoba sannadood dalkaaga
abaari ma kuugu soo degtaa? Mase saddex bilood baad
cadaawayaashaada ka cararaysaa iyagoo ku eryanaya?
Mase saddex maalmood baa belaayo dalkaaga lagu soo
dejiyaa? Haddaba tasho, oo ka fiirso jawaabta aan u celiyo
kii i soo diray. **14** Markaasaa Daa'uud wuxuu Gaad ku yidhi,
Cidhiidhi weyn baan ku jiraa; haddaba Rabbiga gacantiisa
aan ku dhacno; waayo, naxariistiisu waa badan tahay;
laakiinse yaanan dad gacantiis ku dhicin. **15** Saas aawadeed
Rabbigu belaayo ayuu ku soo dejiyey reer binu Israa'iil,
taasoo timid subaxdii iyo ilaa wakhtigii loo qabtay; oo ilaa
Daan iyo tan iyo Bi'ir Shebac waxaa dadkii ka dhintay
toddobaatan kun oo nin. **16** Markii malaggii gacanta u
fidiyey inuu baabbi'iyo Yeruusaalem ayaa Rabbigu belaayadii
ka qoomamooday, oo wuxuu ku yidhi malaggii dadka
baabbi'inayay, Bes weeye, haddaba gacanta soo celi. Oo
malaggii Rabbiguna wuxuu ag joogay meeshii hadhuudhka
lagu tumi jiray oo uu Arawnaah kii reer Yebuus lahaa. **17**
Markaasaa Daa'uud wuxuu la hadlay Rabbiga kolkuu arkay
malaggii dadka laayay, oo yidhi, Bal eeg, waan dembaabay,
oo wax qalloocan baan sameeyey, laakiinse idahanu maxay
sameeyeen? Haddaba waan ku baryayaaye, gacantaadu ha
ka gees noqoto aniga iyo reerka aabbahay. **18** Oo Gaadna
maalintaas ayuu Daa'uud u yimid, oo ku yidhi, Tag, oo
Rabbiga meel allabari uga dhis meeshii hadhuudhka lagu
tumi jiray ee Arawnaahkii reer Yebuus. **19** Oo Daa'uud baa
ku tegey wixii uu Gaad ku yidhi iyo sidii Rabbigu ku amray.
**20** Oo Arawnaah ayaa arkay boqorkii iyo addoommadiisii oo
xaggiisa u soo socda; markaasaa Arawnaah soo baxay, oo
boqorka hortiisii ayuu ku sujuuday, wejigana dhulkuu saaray.
**21** Oo Arawnaah wuxuu yidhi, Boqorow, sayidkaygiiyow,
maxaad iigu timid anoo addoonkaaga ah? Oo Daa'uudna
wuxuu yidhi, Waxaan kuugu imid inaan kaa iibsado meesha
wax lagu tumo, si aan Rabbiga uga dhiso meel allabari inay
belaayadu dadka ka joogsato. **22** Oo Arawnaahna wuxuu
Daa'uud ku yidhi, Boqorow, sayidkaygiiyow, qaado oo Ilaah
u bixi wax alla wixii kula wanaagsan; bal eeg, waa kuwan
dibidii qurbaanka la gubo, waana kuwan alaabtii wax lagu

tumayay iyo alaabtii dibidu si ay qoryihii u noqdaan. **23**
Boqorow, waxan oo dhan anoo Arawnaah ah ayaan ku
siinayaa. Oo Arawnaah wuxuu boqorkii ku yidhi, Rabbiga
Ilaahaaga ahu ha ku aqbalo. **24** Markaasaa boqorkii wuxuu
Arawnaah ku yidhi, Maya, laakiinse sida runta ah qiimaan
kaaga iibsanayaa, oo Rabbiga Ilaahayga ahna qurbaanno la
gubo ugu bixin maayo wax aanan waxba ka bixin. Haddaba
Daa'uud wuxuu meeshii wax lagu tumi jiray iyo dibidiiba
ku iibsaday konton sheqel oo lacag ah. **25** Markaasaa
Daa'uud halkaas Rabbiga uga dhisay meel allabari, oo wuxuu
u bixiyey qurbaanno la gubo iyo qurbaanno nabaadiino.
Haddaba Rabbigu waa aqbalay baryadii dalkii loo baryay, oo
belaayadiina dalkii way ka joogsatay.

# Boqorradii Kowaad

**1** Haddaba Boqor Daa'uud wuu gaboobay, da' buuna la dhacay, oo waxay huwiyeen dhar, laakiinse kulayl ma uu helin. **2** Sidaas daraaddeed addoommadiisii waxay ku yidhaahdeen, Boqorow, Sayidkayagiiyow, ha laguu doono gabadh dhallinyar oo bikrad ah, oo taasu ha istaagto hortaada, waxna ha kuu tarto, oo laabtaadana ha ku jiifto, si aad kulayl u hesho, Boqorow, Sayidkayagiiyow. **3** Sidaas daraaddeed gabadh qurxoon ayay ka doondooneen dalkii Israa'iil oo dhan, oo waxay soo heleen Abiishag oo ahayd reer Shuuneem, oo taas bay boqorkii u keeneen. **4** Oo gabadhuna aad bay u qurxoonayd, oo boqorkiina wax bay u tari jirtay, oo u adeegi jirtay, laakiinse boqorku iyadii ma uu taaban. **5** Markaasaa Adoniiyaah oo ay Haggiid dhashay isweyneeyey, oo yidhi, Anigaa boqor noqon doona; oo wuxuu diyaarsaday gaadhifardood iyo rag fardooley ah, iyo konton nin oo hortiisa orodda. **6** Oo aabbihiisna marna kama calool xumayn isagii oo kuma odhan, War maxaad saas u yeeshay? Wuxuuna ahaa nin qurux badan, oo Absaaloom dabadiis dhashay. **7** Oo isna wuxuu la hadlay Yoo'aab oo ay Seruuyaah dhashay, iyo wadaadkii Aabyaataar; oo iyana intay Adoniiyaah raaceen ayay caawiyeen. **8** Laakiinse Saadooq oo ahaa wadaad, iyo Benaayaah ina Yehooyaadaac, iyo Nebi Naataan, iyo Shimcii iyo Reecii, iyo raggii xoogga badnaa oo Daa'uud lahaa midkoodna Adoniiyaah lama jirin. **9** Markaasaa Adoniiyaah wuxuu ido iyo dibi iyo neefaf shishilis ku qalay meel u dhow dhagaxa Soxeled oo ku dhinac yaal Ceyn Rogeel, oo wuxuu u wada yeedhay walaalihiis ilmo boqor, iyo raggii reer Yahuudah oo boqorka addoommadiisa ahaa oo dhan. **10** Laakiinse uma uu yeedhin Nebi Naataan, iyo Benaayaah, iyo raggii xoogga badnaa, iyo walaalkiis Sulaymaan. **11** Markaasaa Naataan la hadlay Batshebac oo Sulaymaan hooyadiis ahayd, oo ku yidhi, Naa miyaadan maqlin inuu boqor noqday Adoniiyaah kii ay Haggiid dhashay, oo sayidkeenna Daa'uudna uusan taas ogayn? **12** Haddaba sidaas daraaddeed waan ku baryayaaye, Bal kaalay aan kula taliyee, si aad u badbaadiso naftaada iyo nafta wiilkaaga Sulaymaanba. **13** Haddaba tag oo u gal Boqor Daa'uud, oo waxaad ku tidhaahdaa, Boqorow, sayidkaygiiyow, miyaadan anoo addoontaada ah iigu dhaaran oo odhan, Hubaal dabaday waxaa boqor ahaan doona wiilkaaga Sulaymaan, carshigayguuna ku fadhiisan doonaa? Haddaba Adoniiyaah muxuu boqor u noqday? **14** Oo bal eeg, intaad boqorka la hadlayso ayaan anna kaa daba iman doonaa, oo waxaan sii adkayn doonaa erayadaada. **15** Markaasaa Batshebac waxay boqorkii ugu gashay qolkii, oo boqorkuna aad buu u gaboobay; oo waxaa boqorka u adeegaysay Abiishag tii reer Shuuneem. **16** Oo Batshebacna intay foororsatay ayay boqorkii u sujuudday. Markaasaa boqorkii wuxuu ku yidhi, Naa maxaad doonaysaa? **17** Markaasay ku tidhi, Sayidow, anoo addoontaada ah waxaad iigu dhaaratay magaca Rabbiga Ilaahaaga ah, adoo leh, Hubaal dabaday waxaa boqor ahaan doona wiilkaaga Sulaymaan, carshigayguuna ku fadhiisan doonaa. **18** Oo haddaba bal eeg, waxaa boqor ah Adoniiyaah, oo adna, sayidow, boqorkaygiiyow, taas ma ogid! **19** Oo isagu wuxuu qalay dibi iyo neefaf shishilis iyo ido badan, oo wuxuu u yeedhay ilmo boqor oo dhan, iyo wadaadka Aabyaataar ah, iyo Yoo'aab oo ah sirkaalkii ciidanka; laakiinse uma uu yeedhin addoonkaaga Sulaymaan. **20** Oo adna, sayidow, boqorkaygiiyow, indhihii dadka dalka Israa'iil oo dhammu adigay ku soo fiirinayaan, inaad u sheegtid qofka ku fadhiisan doona carshigaaga dabadaa, boqorow, sayidkaygiiyow. **21** Haddii kalese, boqorow, sayidkaygiiyow, markaad dhimatid oo aad awowayaashaa la seexatid, aniga iyo wiilkayga Sulaymaanba waxaa lagu tirin doonaa kuwa dembaabay. **22** Oo bal eeg, intii ay weli boqorkii la hadlaysay ayaa Nebi Naataan soo galay. **23** Oo waxaa boqorkii loo soo sheegay, oo lagu yidhi, Waa kan Nebi Naataan. Oo isna markuu soo galay, oo uu boqorkii hor yimid, ayuu ku sujuuday boqorka hortiisa, oo wejigiisuu dhulka saaray. **24** Markaasaa Naataan wuxuu yidhi, Boqorow, sayidkaygiiyow, ma waxaad tidhi, Aniga dabaday waxaa boqor ahaan doona Adoniiyaah, carshigayguuna ku fadhiisan doonaa? **25** Waayo, isagu maantuu tegey, oo qalay dibi iyo neefaf shishilis, iyo ido badan, oo wuxuu u yeedhay ilma boqor oo dhan, iyo saraakiishii ciidanka, iyo wadaadka Aabyaataar ah, oo bal eeg, iyana hortiisay wax ku cunayaan, oo wax ku cabbayaan, oo waxay leeyihiin, Boqor Adoniiyaah ha noolaado. **26** Laakiinse anigoo addoonkaaga ah, iyo wadaadka Saadooq ah, iyo Benaayaah ina Yehooyaadaac, iyo addoonkaaga Sulaymaan ah midna uma uu yeedhin. **27** Ma adaa waxan sameeyey, boqorow, sayidkaygiiyow, adoo aan weli addoommadaada ogeysiin kii carshiga ku fadhiisan lahaa dabadaa, boqorow, sayidkaygiiyow? **28** Markaasaa Boqor Daa'uud wuxuu ugu jawaabay, Iigu yeedha Batshebac. Oo iyana way timid, wayna soo gashay meeshii boqorku joogay, oo soo hor istaagtay boqorkii. **29** Markaasaa boqorkii dhaartay oo yidhi, Waxaan ku dhaartay Rabbigii naftayda cidhiidhi oo dhan ka samatabbixiyey, **30** oo sida runta ah waxaan kuugu dhaartay Rabbiga ah Ilaaha dadka dalka Israa'iil, oo aan kugu idhi, Hubaal aniga dabaday waxaa boqor ahaan doona wiilkaaga Sulaymaan,

carshigayguuna ku fadhiisan doonaa dabaday, haddaba
sida runta ah taas maantaan samaynayaa. **31** Markaasaa
Batshebac foororsatay oo wejigeedii dhulka saartay, oo
waxay u sujuudday boqorkii oo tidhi, Boqor Daa'uudow,
sayidkaygiiyow, weligaaba noolow. **32** Oo Boqor Daa'uudna
wuxuu yidhi, Iigu yeedha wadaadka Saadooq ah, iyo Nebi
Naataan, iyo Benaayaah ina Yehooyaadaac. Oo iyana
boqorkay hor yimaadeen. **33** Markaasaa boqorkii wuxuu
ku yidhi iyagii, Addoommadayda kaxaysta, oo wiilkayga
Sulaymaanna waxaad fuushiisaan baqalkayga oo waxaad
geeysaan Giixoon. **34** Oo wadaadka Saadooq ah iyo
Nebi Naataan isaga halkaas ha ku subkeen, oo ha ka
dhigeen boqorkii dalka Israa'iil; oo markaas waxaad afuuftaan
buunka oo waxaad tidhaahdaan, Boqor Sulaymaan ha
noolaado. **35** Dabadeedna waa inaad soo raacdaan isaga,
oo isna waa inuu yimaado, oo carshigayga ku fadhiisto;
waayo, meeshaydii isagaa boqor ka noqon doona, oo
waxaan ka dhigay amiir u taliya dalka Israa'iil iyo dalka
Yahuudah. **36** Markaasaa Benaayaah ina Yehooyaadaac
boqorkii ugu jawaabay, Aamiin, oo saas ha yidhaahdo
Ilaahaagu, Boqorow, sayidkaygiiyow. **37** Oo sidii Rabbigu uu
kuula jiray, Boqorow, sayidkaygiiyow, saas oo kale ha ula jiro
Sulaymaanna, oo carshigiisana ha ka dhigo mid ka sii weyn
carshigaagii, Boqor Daa'uudow, sayidkaygiiyow. **38** Sidaas
daraaddeed wadaadkii Saadooq ahaa, iyo Nebi Naataan, iyo
Benaayaah ina Yehooyaadaac, iyo reer Kereetiim, iyo kuwii
reer Feleetiiba way wada tageen, oo Sulaymaanna waxay
fuushiiyeen baqalkii Boqor Daa'uud, oo waxay isagii geeyeen
Giixoon. **39** Markaasaa wadaadkii Saadooq ahaa wuxuu
Teendhada kala soo baxay geeskii saliidda ahaa, oo wuxuu
ugu subkay Sulaymaan. Kolkaasay buunkii afuufeen, oo
dadkii oo dhammuna waxay yidhaahdeen, Boqor Sulaymaan
ha noolaado. **40** Oo dadkii oo dhammuna isagii bay soo
raaceen, oo dadkii waxay ka dhawaajiyeen biibiilayaal, oo
aad iyo aadna way u farxeen, sidaas daraaddeed dhulkii
wuxuu la dillaacay dhawaaqoodii. **41** Oo Adoniiyaah iyo
martidiisii isaga la joogtay oo dhammuna taasay maqleen
markay cunitaankii dhammeeyeen. Oo Yoo'aabna markuu
maqlay dhawaaqii buunka ayuu yidhi, War waa maxay
qaylada iyo buuqa magaaladii ka dhacay? **42** Oo intuu weli
hadlayay ayaa waxaa yimid Yoonaataan wiilkii wadaadkii
Aabyaataar ahaa. Kolkaasaa Adoniiyaah ku yidhi, Soo gal,
waayo, nin ragaad tahay, oo war wanaagsan baad waddaaye.
**43** Markaasaa Yoonaataan ugu jawaabay Adoniiyaah, Sida
runta ah Sayidkeenna Boqor Daa'uud wuxuu boqor ka
dhigay Sulaymaan. **44** Oo boqorkiina wuxuu raaciyey isagii
wadaadkii Saadooq ahaa iyo Nebi Naataan, iyo Benaayaah
ina Yehooyaadaac, iyo kuwii reer Kereetiim, iyo kuwii reer
Feleetii, oo iyana waxay isagii fuushiiyeen baqalkii boqorka!
**45** Markaasaa wadaadkii Saadooq ahaa iyo Nebi Naataan
isagii u subkeen oo Giixoon ku boqreen, oo halkaasay ka
yimaadeen iyagoo faraxsan, saas aawadeed ayay magaaladii
haddana u buuqday. Oo qayladii aad maqasheen waa taas.
**46** Oo haddana Sulaymaan wuxuu ku fadhiistay carshigii
boqortooyada. **47** Oo weliba addoommadii boqorku waxay u
yimaadeen inay u duceeyaan sayidkeenna Boqor Daa'uud,
oo waxay yidhaahdeen, Ilaahaagu magaca Sulaymaan ha
ka dhigo mid ka sii wanaagsan magacaaga, oo carshigiisana
ha ka sii weyneeyo carshigaaga, oo boqorkiina wuxuu ku
kor foororsaday sariirtiisii. **48** Oo weliba boqorkii wuxuu
yidhi, Waxaa mahad leh Rabbiga ah Ilaaha dadka Israa'iil,
oo maanta siiyey mid carshigaygii ku fadhiista iyadoo
ay indhahaygu arkaan. **49** Oo Adoniiyaah martidiisii oo
dhammuna way wada cabsadeen, oo intay kaceen ayaa
nin waluba meeshiisii tegey. **50** Oo Adoniiyaahna wuxuu
ka cabsaday Sulaymaan, markaasuu tegey oo qabsaday
geesihii meeshii allabariga. **51** Oo waxaa taas loo soo
sheegay Sulaymaan oo lagu yidhi, Bal eeg, Adoniiyaah ayaa
kaa cabsaday, Boqor Sulaymaanow, oo wuxuu qabsaday
geesihii meeshii allabariga, oo yidhi, Boqor Sulaymaan
maanta ha ii dhaarto inuusan anoo addoonkiisa ah seef igu
dilayn. **52** Markaasaa Sulaymaan wuxuu yidhi, Hadduu isu
muujiyo sida nin qumman, xataa tin keliyuhu dhulka kaga
dhici maayo, laakiinse haddii xumaan laga helo, wuu dhiman
doonaa. **53** Sidaas daraaddeed Boqor Sulaymaan wuu u
cid diray, oo waxaa laga soo kaxeeyey meeshii allabariga.
Oo isna wuu yimid oo u sujuuday Boqor Sulaymaan, oo
Sulaymaanna wuxuu ku yidhi, Orod, gurigaagii tag.

**2** Haddaba waxaa soo dhowaaday wakhtigii Daa'uud
dhiman lahaa; oo wuxuu amray wiilkiisii Sulaymaan oo
ku yidhi, **2** Anigu waxaan marayaa jidka dadka dhulka oo
dhan; haddaba xoog yeelo, oo raganimadaada muuji, **3** oo
Rabbiga Ilaahaaga ahna amarkiisa xaji, si aad jidadkiisa ugu
socoto, oo aad u dhawrto qaynuunnadiisa, iyo amarradiisa,
iyo xukummadiisa, iyo markhaatifurkiisa, si waafaqsan waxa
ku qoran sharciga Muuse inaad ku liibaantid waxa aad
samaynaysid oo dhan, iyo meel kastoo aad u jeesatoba; **4**
inuu Rabbigu oofiyo eraygiisii uu igaga hadlay, isagoo leh,
Carruurtaadu hadday jidkooda dhawraan, oo ay qalbigooda
oo dhan iyo naftooda oo dhanba si run ah hortayda ugu
socdaan, waayi maysid nin carshiga dalka Israa'iil ku
fadhiista. **5** Oo weliba waad og tahay wixii uu Yoo'aab oo
ay Seruuyaah dhashay igu sameeyey, ee uu ku sameeyey

labadii sirkaal oo ciidanka dalka Israa'iil, kuwaasoo ahaa
Abneer ina Neer, iyo Camaasaa ina Yeter, ee uu labadaba
dilay, iyo inuu wakhtiga nabadda dhiiggii dagaalka daadiyey,
oo uu dhiiggii dagaalkana mariyey dhex-xidhkiisa dhexda
ugu xidhnaa, iyo kabahiisa cagaha ugu jiray. **6** Haddaba
wixii kula wanaagsan samee, oo cirrada madaxiisu yaanay
nabad ku gelin xabaasha. **(Sheol h7585)** **7** Laakiinse u roonow
wiilasha Barsillay kan reer Gilecaad, oo iyagu ha noqdeen
kuwa ka mid ah kuwa miiskaaga wax ka cuna, waayo,
saasay iigu yimaadeen markaan walaalkaa Absaaloom ka
cararay. **8** Oo bal eeg, waxaa kula jooga Shimcii ina Geeraa,
oo ah reer Benyaamiinka deggan Baxuuriim, kaasoo habaar
xun igu habaaray maalintii aan Maxanayim tegey; laakiinse
wuu igaga hor yimid Webi Urdun, oo i soo dhoweeyey, oo
anna waxaan isaga ugu dhaartay oo ku idhi, Seef kugu
dili maayo. **9** Sidaas daraaddeed inuu eedlaawe yahay
ha u qaadan, waayo, waxaad tahay nin xigmad leh, oo
waad garan doontaa waxa kuu eg inaad ku samayso, oo
waa inaad cirrada madaxiisa dhiig xabaasha la gelisaa.
**(Sheol h7585)** **10** Oo Daa'uudna wuu dhintay oo la seexday
awowayaashiis, oo waxaa lagu aasay magaaladii Daa'uud.
**11** Oo Daa'uudna wuxuu reer binu Israa'iil boqor u ahaa
afartan sannadood; toddoba sannadood ayuu Xebroon ka
taliyey, saddex iyo soddon sannadoodna ayuu Yeruusaalem
ka taliyey. **12** Oo Sulaymaanna wuxuu ku fadhiistay carshigii
aabbihiis Daa'uud, oo boqortooyadiisiina way sii dhisnaatay.
**13** Markaasaa Adoniiyaah oo ay Haggiid dhashay u yimid
Batshebac oo ahayd Sulaymaan hooyadiis. Oo iyana waxay
ku tidhi, War ma nabad baad ku timid? Isna wuxuu yidhi,
Haah, nabad baan ku imid. **14** Oo weliba wuxuu iyadii ku
yidhi, Muraad baan kaa leeyahay, iyana waxay tidhi, Bal
ii sheeg. **15** Markaasuu ku yidhi, Waad og tahay inaan
boqortooyada lahaa, oo ay dadkii dalka Israa'iil oo dhammu
fiiro ii lahaayeen inaan boqor u noqdo, habase yeeshee
boqortooyadii way rogmatay, oo waxaa yeeshay walaalkay,
waayo, xagga Rabbiga buu ka helay. **16** Haddaba wax
baan ku weyddiisanayaa, hana ii diidin. Iyana waxay tidhi,
Bal ii sheeg. **17** Markaasuu yidhi, Waan ku baryayaaye,
iila hadal Boqor Sulaymaan inuu i siiyo Abiishag tan
reer Shuuneem aan guursadee, (waayo, Maya, ku odhan
maayo.) **18** Markaasaa Batshebac waxay tidhi, Waa hagaag,
boqorka waan kuula hadli doonaa. **19** Sidaas daraaddeed
Batshebac waxay u tagtay Boqor Sulaymaan inay ula
hadasho Adoniiyaah. Boqorkiina wuu u sara joogsaday inuu
iyada soo dhoweeyo, wuuna u foororsaday iyadii, markaasuu
carshigiisii ku fadhiistay, oo wuxuu amray in carshi loo dhigo
hooyadiis, markaasay midigtiisa fadhiisatay. **20** Kolkaasay
tidhi, Wax yar baan kaa baryayaaye, hana ii diidin. Boqorkiina
wuxuu ku yidhi, Hooyoy, ii sheeg, waayo, kuu diidi maayo.
**21** Markaasay tidhi, Abiishag tan reer Shuuneem ha la
siiyo walaalkaa Adoniiyaah ha guursadee. **22** Kolkaasaa
Boqor Sulaymaan hooyadiis ugu jawaabay, Abiishag tan reer
Shuuneem maxaad Adoniiyaah ugu doonaysaa? Haddaba
boqortooyadana u doon, waayo, isagu waa walaalkay iga
weyn, u doon isaga, iyo wadaadka Aabyaataar, iyo Yoo'aab
oo ay Seruuyaah dhashay. **23** Markaasaa Boqor Sulaymaan
Rabbiga ku dhaartay, oo yidhi, Hadalkan uu Adoniiyaah
ku hadlay hadduusan naftiisa ka gees noqon, Ilaah ha igu
sameeyo saas iyo si ka sii badanba. **24** Haddaba waxaan
ku dhaartay nolosha Rabbigii xoogga ii yeelay, oo igu
fadhiisiyey carshigii aabbahay Daa'uud, oo reerka iigu yeelay
siduu iigu ballanqaaday, hubaal Adoniiyaah maanta waa la
dilayaa. **25** Markaasaa Boqor Sulaymaan u diray Benaayaah
ina Yehooyaadaac, oo isna wuu dilay, Adoniiyaahna waa
dhintay. **26** Oo boqorkiina wuxuu wadaadkii Aabyaataar ahaa
ku yidhi, Waxaad tagtaa Canaatood iyo ilaa beerahaagii,
waayo, waxaad istaahishaa in lagu dilo, laakiinse haatan
ku dili maayo, waayo, aabbahay Daa'uud waad ku hor sidi
jirtay sanduuqii Sayidka Rabbiga ah, oo waxaa lagugu dhibi
jiray wax kasta oo aabbahay lagu dhibi jiray. **27** Sidaasuu
Sulaymaan Aabyaataar uga eryay wadaadnimadii Rabbiga
inuu oofiyo Eraygii Rabbiga ee uu kaga hadlay reerka
Ceelii xagga Shiiloh. **28** Markaasaa warkii u yimid Yoo'aab,
waayo, Yoo'aab wuxuu raacay Adoniiyaah in kastoo uusan
raacin Absaaloom. Kolkaasaa Yoo'aab u cararay Teendhadii
Rabbiga, oo qabsaday geesihii meeshii allabariga. **29**
Markaasaa taas loo soo sheegay Boqor Sulaymaan, oo
lagu yidhi, Yoo'aab Teendhadii Rabbiga ayuu u cararay, oo
wuxuu ag jooga meeshii allabariga. Dabadeedna Sulaymaan
wuxuu diray Benaayaah ina Yehooyaadaac oo wuxuu ku
yidhi, Tag oo soo dil. **30** Markaasaa Benaayaah Teendhadii
Rabbiga soo galay oo ku yidhi, Boqorkii wuxuu leeyahay,
Soo bax. Isna wuxuu yidhi, Maya, laakiinse halkanaan ku
dhimanayaa. Oo Benaayaah haddana boqorkii buu u war
keenay oo ku yidhi, Yoo'aab saasuu yidhi, oo saasuu iigu
jawaabay. **31** Markaasaa boqorkii wuxuu ku yidhi, Siduu
kugu yidhi yeel, oo dil isaga, oo soo xabaal, inaad aniga
iyo reerka aabbahayba naga dul qaaddid dhiiggii Yoo'aab
sababla'aanta ku daadiyey. **32** Oo Rabbiguna dhiiggiisa
wuxuu ku celin doonaa madaxiisa, maxaa yeelay, wuxuu
dilay laba nin oo isaga ka xaq badan oo ka wanaagsan,
seef buuna ku dilay, aabbahay Daa'uudna taas waxba kama
ogayn, oo kuwaasuna waxay ahaayeen Abneer ina Neer oo
sirkaal u ahaa ciidanka dalka Israa'iil, iyo Camaasaa ina

Yeter oo sirkaal u ahaa ciidanka dalka Yahuudah. 33 Saas
aawadeed dhiiggoodii wuxuu ku noqon doonaa madaxa
Yoo'aab, iyo madaxa farcankiisa weligiis, laakiinse Daa'uud,
iyo farcankiisa, iyo reerkiisa, iyo carshigiisaba nabad baa
xagga Rabbiga uga ahaan doonta weligeed. 34 Markaasaa
Benaayaah ina Yehooyaadaac tegey, oo intuu ku kor dhacay
ayuu dilay, oo waxaa lagu aasay gurigiisii cidlada ku yiil.
35 Markaasaa boqorkii wuxuu meeshiisii ku beddelay oo
ciidankii madax uga dhigay Benaayaah ina Yehooyaadaac.
Oo meeshii Aabyaataarna wuxuu ku beddelay wadaadkii
Saadooq ahaa. 36 Markaasaa boqorkii u cid diray oo u
yeedhay Shimcii, oo wuxuu ku yidhi, Yeruusaalem guri
ka dhiso, oo halkaas iska deg, oo mar dambe meella ha
uga bixin. 37 Waayo, maalintii aad baxdo oo aad durdurka
Qidroon ka gudubto, bal ogow hubaal inaad dhimanayso;
dhiiggaaguna madaxaaguu ku oolli doonaa. 38 Markaasaa
Shimcii boqorkii ku yidhi, Hadalkaasu waa wanaagsan
yahay, oo sidaad tidhi, boqorow, sayidkaygiiyow, waan yeeli
doonaa, anigoo addoonkaaga ah. Oo Shimciina wakhti dheer
ayuu Yeruusaalem degganaa. 39 Oo saddex sannadood
dabadood, laba addoon oo Shimcii kuwiis ah ayaa u cararay
xagga Aakiish ina Macakaah oo ahaa boqorkii Gad. 40
Markaasaa Shimcii kacay, oo dameerkiisii kooraystay, oo
wuxuu u tegey Aakiish oo Gad jooga inuu addoommadiisii
ka doonto; oo Shimcii wuu tegey oo addoommadiisii ka soo
kaxaystay Gad. 41 Markaasaa Sulaymaan waxaa loo soo
sheegay in Shimcii Yeruusaalem ka kacay, oo uu Gad tegey,
oo uu haddana soo noqday. 42 Markaasaa boqorkii u cid
diray oo Shimcii u yeedhay, oo wuxuu ku yidhi, War miyaanan
Rabbiga kugu dhaarin, oo aanan hore kuugu sii sheegin,
oo aanan kugu odhan, Ogow oo hubso, inaad xaqiiqa
dhimanaysid maalintii aad baxdid oo aad meel kale u kacdid?
Oo adna sow iguma aadan odhan, Hadalkaan maqlay waa
wanaagsan yahay? 43 Haddaba maxaad u dhawri weyday
dhaartii Rabbiga iyo amarkii aan kugu amray? 44 Weliba
boqorkii wuxuu Shimcii ku yidhi, Waad wada og tahay sharka
qalbigaaga ku jira oo aad aabbahay Daa'uud ku samaysay.
Sidaas daraaddeed Rabbigu sharkaagii wuxuu ku soo celin
doonaa madaxaaga. 45 Laakiinse anoo Boqor Sulaymaan
ahu waan barakaysnaan doonaa, oo carshiga Daa'uudna
weligiis wuu ku sii dhisnaan doonaa Rabbiga hortiisa. 46
Sidaas daraaddeed ayaa boqorkii amray Benaayaah ina
Yehooyaadaac; kolkaasuu isna tegey oo dilay Shimcii, wuuna
dhintay. Oo boqortooyadiina waxay ku sii dhisnaatay gacantii
Sulaymaan.

3 Markaasaa Sulaymaan xidhiidh la yeeshay boqorkii Masar
oo Fircoon ahaa, oo soo kaxaystay Fircoon gabadhiisii,
wuxuuna keenay magaaladii Daa'uud ilaa uu dhammeeyey
dhismihii gurigiisa, iyo gurigii Ilaah, iyo derbigii Yeruusaalem
ku wareegsanaa. 2 Oo dadka ayaa ku allabaryi jiray meelaha
sarsare oo keliya, maxaa yeelay, ilaa wakhtigaas ma uu
jirin guri magaca Ilaah loo dhisay. 3 Oo Sulaymaanna
Rabbiga wuu jeclaa, oo wuxuu ku socday qaynuunnadii
aabbihiis Daa'uud; laakiin meelaha sarsare ayuu ku allabaryi
jiray, fooxna ku shidi jiray. 4 Markaasaa boqorkii Gibecoon
tegey inuu ku soo allabaryo; waayo, halkaasaa ahayd
meesha sare ee weyn; oo meeshaas allabariga Sulaymaan
wuxuu ku bixiyey kun qurbaan oo la gubo. 5 Oo Gibecoon
buu Rabbigu Sulaymaan habeennimo riyo ugu muuqday,
markaasaa Ilaah ku yidhi, I weyddiiso wax aan ku siiyo. 6
Markaasaa Sulaymaan wuxuu yidhi, Addoonkaagii Daa'uud
oo aabbahay ahaa aad baad ugu roonaatay, sidii uu hortaada
ugu socday daacadnimo iyo xaqnimo, iyo qalbi kula qumman;
oo roonaantan weyn ayaad u sii dhawrtay, waayo, waxaad
isagii siisay wiil carshigiisii ku fadhiista, sida ay maanta tahay.
7 Haddaba Rabbigayow, Ilaahow, anoo addoonkaaga ah,
boqor baad iiga dhigtay meeshii aabbahay Daa'uud; laakiinse
waxaan ahay wiil yar, oo garan maayo si loo baxo iyo si loo
soo galo toona. 8 Oo anoo addoonkaaga ahuna waxaan
dhex joogaa dadkaagii aad dooratay, oo ah dad badan oo
aan la tirin karin, lana xisaabi karin faro badnaantooda. 9
Sidaas daraaddeed anoo addoonkaaga ah i sii qalbi wax
garanaya oo aan dadkaaga ku xukumo, si aan ku kala
garto xumaanta iyo samaanta, waayo, bal yaa kara inuu
dadkaagan badan xukumo? 10 Oo hadalkaasuna Sayidka
wuu ka farxiyey markii Sulaymaan waxaas weyddiistay.
11 Markaasaa Ilaah wuxuu ku yidhi, Weyddiisashada aad
waxaas i weyddiisatay aawadeed, oo aadan cimri dheer i
weyddiisan, oo aadan maal i weyddiisan, ama xataa aadan
i weyddiisan nolosha cadaawayaashaada, laakiinse aad i
weyddiisatay waxgarasho aad ku garatid xukunka, 12 ayaan
kuugu yeelay wixii aad i weyddiisatay, oo bal eeg, waxaan
ku siiyey qalbi caqli iyo waxgarasho leh, sidaas daraaddeed
mid kula mid ahu hortaa ma jirin, dabadaana mid kula mid
ahu ma jiri doono. 13 Oo weliba wixii aadan i weyddiisanna
waan ku siiyey oo ah maal iyo derejoba, sidaas daraaddeed
boqor kula mid ahu ma jiri doono cimrigaaga oo dhan. 14
Oo haddaad ku socoto jidadkayga sidii aabbahaa Daa'uud
ugu socday oo kale oo aad dhawrtid qaynuunnadayda iyo
amarradayda markaas cimrigaaga waan dheerayn doonaa.
15 Markaasaa Sulaymaan toosay, oo bal eeg waxay ahayd
riyo; oo intuu Yeruusaalem yimid ayuu hor istaagay sanduuqii

axdiga Rabbiga, oo wuxuu bixiyey qurbaanno la gubo iyo
qurbaanno nabaadiino, oo addoommadiisii oo dhan ayuu
diyaafad u sameeyey. **16** Markaasaa waxaa boqorkii u yimid
oo is-hor taagay laba naagood oo dhillooyin ah. **17** Oo
naagihii middood baa waxay ku tidhi, Sayidow, aniga iyo
naagtanu isku guri baannu deggan nahay, oo anigu gurigaan
ku umulay iyadoo joogta. **18** Oo maalintii aan umulay tii
ka saddex ahayd ayay naagtanuna umushay, waannuna
wada joognay, oo labadayada mooyaane cid qalaadi guriga
nagulama jirin. **19** Oo naagtan ilmaheediina habeenkii buu
dhintay, maxaa yeelay, iyadaa ku dul seexatay. **20** Markaasay
habeenbadhkii kacday, intii anoo addoontaada ahu aan
hurday, oo ilmahaygii dhinacayga ka qaadatay, oo laabta
gashatay, keedii dhintayna anigay laabta ii gelisay. **21** Oo
markaan subaxdii toosay oo aan damcay inaan ilmahayga
nuujiyo ayaan arkay inuu dhintay, laakiinse subaxdiiba
markaan u fiirsaday ayaan ogaaday inuusan ahayn wiilkaygii
aan dhalay. **22** Oo naagtii kalena waxay tidhi, Saas ma
aha, laakiinse kan noolu waa wiilkaygii, kan dhintayna
waa wiilkaagii. Iyaduna waxay tidhi, Maya ee kan dhintay
waa wiilkaagii, kan nooluna waa wiilkaygii. Oo sidaasay
boqorka hortiisii ugu hadleen. **23** Markaasaa boqorkii wuxuu
yidhi, Midu waxay leedahay, Kan noolu waa wiilkaygii, kan
dhintayna waa wiilkaagii; tan kalena waxay leedahay, Maya,
laakiinse wiilkaagii waa kan dhintay, wiilkaygiise waa kan
nool. **24** Markaasaa boqorkii wuxuu yidhi, Bal seef ii keena.
Kolkaasay boqorkii seef u keeneen. **25** Oo haddana boqorkii
wuxuu yidhi, Ilmaha nool laba u kala qaybiya, oo middood
badh siiya, badhka kalena tan kale siiya. **26** Markaasaa
naagtii wiilka nool lahayd boqorkii la hadashay oo ku tidhi,
Sayidow, wiilka nool iyada sii, laakiinse sinaba ha u dilin,
waayo, waxay u calool jilicsanaatay wiilkeeda. Laakiinse tii
kale waxay tidhi, Anigu yeelan maayo, adna yeelan maysid
ee qaybi. **27** Markaasaa boqorkii wuxuu ku jawaabay, Wiilka
nool iyada siiya oo hana dilina, maxaa yeelay, iyadu waa
hooyadiis. **28** Oo dadkii dalka Israa'iil oo dhammuna way
wada maqleen xukunkii boqorku wax ku xukumay, wayna ka
baqeen boqorkii; maxaa yeelay, waxay arkeen in xigmaddii
Ilaah ku jirto si uu wax u xukumo.

**4** Oo Boqor Sulaymaanna boqor buu u ahaa dadkii Israa'iil
oo dhan. **2** Oo kuwanuna amiirradiisii bay ahaayeen,
Casaryaah oo uu dhalay wadaadkii Saadooq ahaa, **3**
Eliixoref iyo Axiiyaah oo ahaa ilma Shiisha waxay ahaayeen
karraaniyo, Yehooshaafaad ina Axiiluudna wuxuu ahaa
taariikhdhige; **4** Benaayaah ina Yehooyaadaacna wuxuu u
sarreeyey ciidanka; oo Saadooq iyo Aabyaataarna waxay
ahaayeen wadaaddo; **5** oo Casaryaah ina Naataanna
wuxuu u sarreeyey saraakiisha; oo Saabuud ina Naataanna
wuxuu ahaa wadaad, boqorkana saaxiib buu la ahaa; **6**
oo Axiishaarna wuxuu u sarreeyey shuqulka guriga; oo
Adoniiraam ina Cabdaana wuxuu ahaa gabbaroqaade. **7**
Oo Sulaymaan wuxuu lahaa laba iyo toban wakiil oo dalka
Israa'iil oo dhan u sarreeya, oo cunto u keena boqorka iyo
reerkiisaba; oo nin kasta sannaddiiba bil buu masruufi jiray
reer boqor. **8** Haddaba waa kuwan magacyadoodii: Benxuur
oo wakiil ka ahaa dalka buuraha leh oo Efrayim; **9** Bendeqer
oo wakiil ka ahaa Maqas, iyo Shacalbiim, iyo Beytshemesh
iyo Eeloon Beytxaanaan; **10** Benxesed oo wakiil ka ahaa
Arubood oo lahaa Sokoh iyo dalka Heefer oo dhan; **11**
Benabiinaadaab oo wakiil ka ahaa meelaha dhaadheer
ee Door oo dhan, oo wuxuu qabay Taafad oo ahayd ina
Sulaymaan, **12** iyo Bacanaa ina Axiiluud oo wakiil ka ahaa
Tacanaag iyo Megiddoo, iyo Beytshe'aan oo dhan oo ku
ag taal Saaretaan, Yesreceel hoosteeda, laga soo bilaabo
Beytshe'aan ilaa Aabeel Mehoolaah, iyo tan iyo Yoqmecaam
shishadeeda; **13** Bengeber oo wakiil ka ahaa Raamod
Gilecaad, oo lahaa magaalooyinka Yaa'iir ina Manaseh oo
Gilecaad ku yaal oo dhan; oo isagu xataa wuxuu wakiil ka
ahaa gobolka Argob oo ku yaal Baashaan, oo lahaa lixdan
magaalo oo waaweyn oo derbi ku wareegsan yahay iyo
biro naxaas ah. **14** Axiinaadaab ina Iddo oo Maxanayim
wakiil ka ahaa; **15** iyo Axiimacas oo wakiil ka ahaa Naftaali
oo isna qabay Sulaymaan gabadhiisii Basemad ahayd; **16**
iyo Bacanaa ina Xuushay oo wakiil ka ahaa Aasheer iyo
Becaalood; **17** iyo Yehooshaafaad ina Faaruu'ax oo Isaakaar
wakiil ka ahaa; **18** iyo Shimcii ina Eelaa, oo reer Benyaamiin
wakiil ka ahaa: **19** iyo Geber ina Uurii oo wakiil ka ahaa
dalka Gilecaad oo ah waddankii Siixon oo ahaa boqorkii reer
Amor, iyo waddankii Coog boqorkii Baashaan. Oo dalkaas oo
dhan keligii baa wakiil ka ahaa. **20** Oo dadkii Yahuudah iyo
dadkii Israa'iilna waxay u faro badnaayeen sida cammuudda
badda xeebteeda taal, oo wax bay cunayeen, wax bayna
cabbayeen, wayna farxayeen. **21** Oo Sulaymaanna wuxuu
xukumi jiray boqortooyooyinkii oo dhan tan iyo Webiga iyo
ilaa dalka reer Falastiin, iyo tan iyo soohdinta Masar, oo
waxay Sulaymaan u keeni jireen hadiyado, wayna u adeegi
jireen intuu noolaa oo dhan. **22** Oo Sulaymaan maalintiiba
wuxuu masruufan jiray soddon kor oo bur ah, iyo lixdan
kor oo jidhiidh ah, **23** iyo toban dibi oo buurbuuran, iyo
labaatan dibi oo daaqa laga soo bixiyey, iyo boqol neef oo
ido ah, oo ayan ku jirin deerooyin, cawl, iyo dibtaago, iyo
digaag la cayiliyey. **24** Waayo, isagaa xukumay Webiga
dhankiisan oo dhan, marka laga bilaabo Tifsax iyo ilaa

Gaasa, iyo kulli boqorradii webiga dhankiisan joogay oo
dhan; oo hareerihiisa oo dhanna nabad buu la ahaa. 25 Oo
wakhtigii Sulaymaan oo dhan dadkii Yahuudah iyo dadkii
Israa'iilna ammaan bay ku degganaayeen, oo nin waluba
wuxuu hoos fadhiyey geedkiisii canabka ahaa iyo geedkiisii
berdaha ahaa marka laga bilaabo Daan iyo xataa ilaa Bi'ir
Shebac. 26 Oo Sulaymaanna wuxuu gaadhifardoodkiisii
u haystay afartan kun oo xero oo fardo ah iyo laba iyo
toban kun oo fardooley ah. 27 Oo wakiilladaasuna waxay
masruuf u keeni jireen Boqor Sulaymaan, iyo intii Boqor
Sulaymaan miiskiisii timid oo dhan, wakiil waluba bishiisii,
oo ma ay oggolaanin in wax ka dhinmo. 28 Oo meesha
wakiilladu joogaan ayay fardaha iyo rakuubbada ugu keeni
jireen shaciir iyo caws, nin waluba intii lagu amray. 29 Oo
Ilaahna wuxuu Sulaymaan siiyey xigmad iyo waxgarasho
aad iyo aad u badan, iyo qalbi ballaadhan, kuwaasoo badan
sida cammuudda badda xeebteeda taal. 30 Oo Sulaymaan
xigmaddiisiina waxay ka fiicnaatay xigmaddii dadka bari
oo dhan, iyo xigmaddii Masar oo dhan, 31 maxaa yeelay,
isagu wuu ka xigmad badnaa dadka oo dhan, oo xataa wuu
ka xigmad badnaa Eetaankii reer Esraax, iyo Heemaan,
iyo Kalkol, iyo Dardaac, kuwaasoo ahaa ilma Maaxool;
oo warkiisiina wuxuu gaadhay quruumihii hareerihiisa ku
wareegsanaa oo dhan. 32 Oo wuxuu ku hadlay saddex
kun oo maahmaahood; oo gabayadiisuna waxay ahaayeen
kun iyo shan. 33 Oo wuxuu ka hadlay geedaha, intuu ka
bilaabay Kedarka Lubnaan ku yaal, ilaa uu gaadhay husobka
derbiga ka soo baxa; oo dugaaggana wuu ka hadlay, iyo
haadka, iyo waxyaalaha gurguurta, iyo kalluunka. 34 Oo qaar
baa ka yimid dadyowga oo dhan, inay maqlaan xigmadda
Sulaymaan kuwaasoo ka yimid boqorradii dunida oo dhan
ee xigmaddiisa maqlay.

5 Oo Xiiraam oo ahaa boqorkii Turos wuxuu Sulaymaan
u soo diray addoommadiisii, waayo, wuxuu maqlay
inay meeshii aabbihiis isaga boqradeen; waayo, Xiiraam
weligiisba wuxuu jeclaa Daa'uud. 2 Oo Sulaymaanna
Xiiraam buu u cid diray oo ku yidhi, 3 Waad og tahay in
aabbahay Daa'uud guri u dhisi kari waayay magaca Rabbiga
Ilaahiisa ah, dagaalladii dhinac kasta kaga wareegsanaa
aawadood, ilaa Rabbigu u wada geliyey cagihiisa hoostooda.
4 Laakiinse haatan Rabbigu waa iga nasiyey dhinac kastaba,
oo lama arko cadow iyo wax xun toona. 5 Oo waxaan
damacsanahay inaan guri u dhiso magaca Rabbiga Ilaahayga
ah, sidii Rabbigu u sheegay aabbahay Daa'uud, isagoo
leh, Wiilkaaga oo aan dabadaa carshigaaga ku fadhiisin
doono ayaa magacayga guri u dhisi doona. 6 Haddaba
sidaas daraaddeed amar in Lubnaan layga soo jaro geedo
kedar ah, oo addoommadayduna waxay la jiri doonaan
addoommadaada, oo addoommadaadana in alla intii aad
tidhaahdid ayaan kaaga kiraysan; waayo, waad garanaysaa
inaan dhexdayada lagu arag wax dhirta u jari kara sida reer
Siidoon. 7 Oo markii Xiiraam maqlay hadalkii Sulaymaan
ayuu aad u farxay oo yidhi, Maanta waxaa mahad leh
Rabbiga Daa'uud siiyey wiil xigmad leh oo u taliya dadkan
badan. 8 Markaasaa Xiiraam Sulaymaan u cid diray oo
wuxuu ku yidhi, Waan maqlay farriintii aad ii soo dirtay; oo
waan yeelayaa waxaad doonayso oo ku saabsan qoryaha
kedarka ah iyo qoryaha berooshka la yidhaahdo. 9 Oo
addoommadayda ayaa Lubnaan ka soo qaadi doona, oo
keeni doona ilaa badda; oo xidhmooyin baan ka dhigayaa si
ay badda u raacaan ilaa meeshii aad igula ballantay, oo
waxaan ka dhigi doonaa in halkaas lagu kala furfuro, oo
waad qaadan doontaa; oo adna waxaan doonayo ayaad ii
dhammayn doontaa, adoo reerkayga cunto ii siinaya. 10
Sidaasuu Xiiraam u siiyey Sulaymaan qoryo kedar ah iyo
qoryo beroosh ah, intuu doonayay oo dhan. 11 Sulaymaanna
wuxuu Xiiraam siiyey labaatan kun oo kor oo sarreen ah
oo reerkiisu quuto, iyo labaatan kor oo saliid saafiya ah;
oo Sulaymaan intaasuu sannad kasta siin jiray Xiiraam.
12 Oo Rabbiguna wuxuu Sulaymaan siiyey xigmad siduu
ugu ballanqaaday; oo Xiiraam iyo Sulaymaanna nabad
baa u dhexaysay, oo labadoodu axdi bay dhigteen. 13
Oo Boqor Sulaymaanna wuxuu dadkii Israa'iil oo dhan ka
dhex doortay niman shaqaalayaal ah, oo shaqaalayaashuna
waxay ahaayeen soddon kun oo nin. 14 Oo bishiiba toban
kun ayuu Lubnaan u diri jiray; markaasay intii bil ah Lubnaan
joogi jireen, laba biloodna reerahooday joogi jireen; oo
shaqaalayaasha waxaa u sarreeyey Adoniiraam. 15 Oo
Sulaymaanna wuxuu lahaa toddobaatan kun oo xammaal
iyo siddeetan kun oo nin oo buuraha geedo ka jari jiray. 16
Oo laguma tirin Sulaymaan saraakiishiisii sarsare oo hawsha
u taliyey, kuwaasoo ahaa saddex kun iyo saddex boqol oo u
talin jiray dadkii shuqulka qaban jiray. 17 Markaasaa boqorkii
amray, oo iyana waxay soo jareen dhagxan waaweyn oo
qaali ah, inay dhagxan la qoray ka dhigaan aasaaskii
guriga. 18 Oo Sulaymaan waxdhisayaashiisii iyo Xiiraam
waxdhisayaashiisii iyo reer Gebal ayaa qoray, oo waxay
hagaajiyeen alwaaxdii iyo dhagxantii guriga lagu dhisi lahaa.

6 Oo Sulaymaan wuxuu bilaabay inuu gurigii Rabbiga dhiso
markay ahayd afar boqol iyo siddeetan sannadood, kolkii
reer binu Israa'iil dalka Masar ka soo baxeen dabadeed,
taasoo ahayd sannaddii afraad oo Sulaymaan boqorka u
noqday dadkii Israa'iil, bisheedii labaad taasoo ah bisha

Sif. 2 Oo gurigii Sulaymaan Rabbiga u dhisay dhererkiisu
wuxuu ahaa lixdan dhudhun, ballaadhkiisuna wuxuu ahaa
labaatan dhudhun, sarajooggiisuna wuxuu ahaa soddon
dhudhun. 3 Oo guriga meeshiisa quduuska ah horteedana
waxaa ku tiil balbalo, oo dhererkeedu wuxuu ahaa labaatan
dhudhun sida guriga ballaadhkiisa; oo xagga guriga hortiisana
ballaadhkeedu wuxuu ahaa toban dhudhun. 4 Oo gurigana
wuxuu u yeelay daaqado shabag leh. 5 Oo guriga derbigiisa
wuxuu ku xijisiiyey dabaqado ku wareegsan derbiyada
guriga kaasoo ah macbudka iyo meesha ugu quduusanba;
oo dhinacyadana wuxuu u yeelay qolal ku wareegsan. 6
Oo dabaqadda ugu hoosaysa ballaadhkeedu wuxuu ahaa
shan dhudhun, tan dhexena ballaadhkeedu wuxuu ahaa
lix dhudhun, tan saddexaadna ballaadhkeedu wuxuu ahaa
toddoba dhudhun; oo inaan dogobbada sarsare ee guriga
haya guriga gudihiisa soo gelin aawadeed ayuu guriga
dibaddiisa ugu yeelay meelo la saaro. 7 Oo markii guriga la
dhisayay waxaa lagu dhisay dhagxan lagu soo diyaariyey
meeshii laga soo qoday; oo intii guriga la dhisayay guriga
dhexdiisa laguma maqlin dubbe ama faas ama alaab kale
oo bir ah. 8 Oo qolalka dabaqadda hoose albaabkoodu
wuxuu ku yiil guriga dhankiisa midigta ah; dabaqadda
dhexena waxaa kor loogu fuuli jiray jaranjaro warwareegta
iyo weliba marka laga baxo tan dhexe ilaa laga galo tan
saddexaad. 9 Sidaasuu gurigii u dhisay oo u dhammeeyey,
oo wuxuu ku deday dogobbo iyo safaf alwaax kedar ah. 10
Oo dabaqadihii wuxuu ka wada dhisay guriga wareeggiisa
oo dhan, oo mid kastaba sarajooggiisu wuxuu ahaa shan
dhudhun; oo waxay kor saarnaayeen alwaax kedar ah.
11 Oo Sulaymaanna waxaa u yimid Eraygii Rabbiga, oo
wuxuu ku yidhi, 12 Gurigan aad dhisayso waxaan kaa
leeyahay, Haddaad qaynuunnadayda ku socotid, oo aad
xukummadayda yeeshid, oo aad amarradayda oo dhan
dhawrtid inaad ku socotid aawadeed, markaasaan kugu
xoojin doonaa eraygaygii aan aabbahaa Daa'uud kula hadlay.
13 Oo waxaan dhex joogi doonaa reer binu Israa'iil, oo
kama tegi doono dadkayga reer binu Israa'iil. 14 Sidaasaa
Sulaymaan gurigii u dhisay oo u dhammeeyey. 15 Oo guriga
derbiyadiisii gudaha ahaa wuxuu ka dhisay looxyo kedar ah;
oo xagga gudaha salka iyo baarka inta ka dhex leh alwaax
buu ku deday; oo dhulkii guriga dhexdiisa ahaana wuxuu ku
deday looxyo beroosh ah. 16 Oo guriga xaggiisa dambe,
salka iyo ilaa derbiyada labaatan dhudhun buu ku dhisay
looxyo kedar ah, oo weliba wuxuu gudaha ka dhisay meel
quduus ah, taasoo ah meesha ugu wada quduusan. 17 Oo
guriga macbudka ah ee ka horreeyey dhererkiisu wuxuu
ahaa afartan dhudhun. 18 Oo guriga gudihiisa waxaa ku jiray
qori kedar ah oo la xardhay oo ubbooyin iyo ubax furan loo
yeelay; oo kulli wuxuu ahaa qori kedar ah, oo dhagax laguma
arag. 19 Oo gurigii dhexe badhtankiisa wuxuu ka diyaariyey
meel quduus ah inuu dhigo sanduuqii axdiga Rabbiga. 20
Oo meesha ugu quduusan waxay lahayd meel dhererkeedu
ahaa labaatan dhudhun, ballaadhkeeduna ahaa labaatan
dhudhun, sarejooggeeduna ahaa labaatan dhudhun; oo
wuxuu ku wada dahaadhay dahab saafi ah; oo meeshii
allabarigana wuxuu ku deday qori kedar ah. 21 Sidaasuu
Sulaymaan gurigii gudaha ku yiil ugu dahaadhay dahab saafi
ah; oo silsilado dahab ah ayuu ku xidhay meeshii quduuska
ahayd horteeda, wuxuuna ku wada dahaadhay dahab. 22
Oo guriga oo dhanna wuxuu ku dahaadhay dahab jeer uu
gurigii oo dhammu dhammaaday. Oo meesha ugu quduusan
meesheedii allabarigana wuu ku dahaadhay dahab. 23 Oo
meeshii ugu quduusnaydna wuxuu u yeelay laba keruub oo
qoryo saytuun ah, oo mid walbana dhererkiisu wuxuu ahaa
toban dhudhun. 24 Oo keruubka baalkiisu wuxuu ahaa shan
dhudhun, baalkiisa kalena shan dhudhun; oo baal caaraddiis
iyo kan kale caaraddiisu waxay isu jireen toban dhudhun.
25 Oo keruubka kalena wuxuu ahaa toban dhudhun, oo
labada keruubna waxay ahaayeen isku qiyaas iyo isku
qaab. 26 Oo keruubiimta midkood sarajooggiisu wuxuu
ahaa toban dhudhun, oo kan kalena saasoo kaluu ahaa.
27 Oo keruubiimtiina wuxuu dhigay gurigii dhexe gudihiisa,
oo keruubiimta baalashooduna way kala baxsanaayeen
oo mid baalkiisu wuxuu taabtay derbiga, oo keruubka kale
baalkiisuna wuxuu taabtay derbiga kale; oo baalashooduna
waxay isku taabteen guriga dhexbadhtankiisa. 28 Oo
keruubiimtana wuxuu ku dahaadhay dahab. 29 Oo gurigii
derbiyadiisii oo dhan, gudaha iyo dibaddaba wuxuu ku
xardhay sawirro keruubiim, iyo geedo timireed, iyo ubaxyo
wada furan. 30 Oo guriga dhulkiisana ayuu dahab ku
dahaadhay gudaha iyo dibaddaba. 31 Oo meesha ugu
quduusan iriddeedana wuxuu u yeelay albaabbo ah qoryo
saytuun; fayaaraddu labadeeda dhinac iyo meesheeda sare
waxay ahaayeen derbiga meeshiisii shanaad. 32 Sidaasuu u
sameeyey laba albaab oo qoryo saytuun ah, oo wuxuu ku
xardhay sawirro keruubiim, iyo geedo timireed, iyo ubaxyo
furan, oo wuxuu ku dahaadhay dahab, oo dahabkiina wuxuu
mariyey keruubiimtii iyo geedihii timirta ahaa. 33 Oo sidaas
oo kaluu albaabkii macbudkana ugu yeelay fayaarad qoryo
saytuun ah, kaasoo ku yiil derbiga meeshiisa afraad; 34 iyo
laba albaab oo qoryo beroosh ah; oo albaabbada midkood
wuxuu lahaa laba qaybood oo laabma, kan kalena wuxuu
lahaa laba qaybood oo laabma. 35 Oo wuxuu ku xardhay
keruubiim iyo geedo timireed, iyo ubaxyo furan; oo wuxuu ku

dahaadhay dahab la mariyey xaradhkii. **36** Oo barxaddii
dhexena wuxuu u yeelay saddex saf oo dhagax la qoray ah
iyo saf alwaax kedar ah. **37** Oo gurigii Rabbiga aasaaskiisii
waxaa la dhigay bishii Sif oo sannaddii afraad. **38** Oo
gurigii waxaa dhammaantiis la dhammeeyey isagoo wax
waluba u dhan yahay sannaddii kow iyo tobnaad, bisheedii
siddeedaad, taasoo ah bisha Bul, oo wuxuu dhisayay
toddoba sannadood.

**7** Oo Sulaymaan gurigiisana wuxuu dhisayay saddex
iyo toban sannadood, oo gurigiisii oo dhanna wuu
dhammeeyey. **2** Waayo, guriga wuxuu ka dhisay
geedihii Lubnaan, oo dhererkiisu wuxuu ahaa boqol
dhudhun, ballaadhkiisuna wuxuu ahaa konton dhudhun,
sarajooggiisuna wuxuu ahaa soddon dhudhun, oo wuxuu
ku dul taagnaa afar saf oo tiirar kedar ah, oo tiirarkana
waxaa dul saarnaa alwaax waaweyn oo kedar ah. **3** Oo
waxaa ku dednaa qoryo kedar ah oo ka sarreeya shan iyo
afartanka loox oo tiirarka dul saarnaa, ee shan iyo tobanba
saf ahaayeen. **4** Oo wuxuu lahaa saddex saf oo dariishado
ah, oo saddexda saf iftiinkooduna midba mid buu ka soo
hor jeeday. **5** Oo albaabbada oo dhan iyo dariishadaha oo
dhammu waxay wada ahaayeen afargees, oo saddexda saf
iftiinkooduna midba mid buu ka soo hor jeeday. **6** Oo wuxuu
sameeyey balbalo tiirar ah; oo dhererkeedu wuxuu ahaa
konton dhudhun, ballaadhkeeduna wuxuu ahaa soddon
dhudhun, oo balbalona waa ka horraysay, iyadoo leh tiirar iyo
looxyo balballaadhan. **7** Oo wuxuu kaloo sameeyey balbaladii
carshiga oo ahayd meeshii uu wax ku xukumi lahaa, oo
taasu waxay ahayd balbaladii xukunka; oo dhulkeedana
waxaa ku dednaa alwaax kedar ah. **8** Oo gurigiisii uu degi
lahaana wuxuu ku yiil balbalada barxaddeeda kale, oo
isku si baana loo dhisay. Oo guri balbaladan u eg ayuu u
dhisay gabadhii Fircoon (oo Sulaymaan guursaday). **9** Oo
kuwanu dhammaantood waxay ahaayeen dhagxan qaali
ah oo qiyaas loo qoray, oo kor iyo hoosba miinshaaro lagu
gooyay tan iyo salka iyo baarka, oo dibadduna saasay ahayd
tan iyo barxadda weyn. **10** Oo aasaaskuna wuxuu ahaa
dhagxan qaali ah oo waaweyn, oo qaarna waxay ahaayeen
toban dhudhun, qaarna waxay ahaayeen siddeed dhudhun.
**11** Oo korkana waxaa jiray dhagxan qaali ah oo qiyaas loo
qoray, iyo alwaax kedar ah. **12** Oo barxadda weyn ee ku
wareegsanna waxay lahayd saddex saf oo dhagxan qoran
ah, iyo saf ah looxyo waaweyn oo kedar ah, oo waxay
la mid ahayd guriga Rabbiga barxaddiisa hoose iyo sida
balbalada guriga. **13** Oo Boqor Sulaymaanna Xiiraam cid
buu u diray oo Turos ka soo kexeeyey. **14** Oo Xiiraam waxaa
dhashay naag carmal ah oo qabiilkeedu yahay reer Naftaali,
aabbihiisna wuxuu ahaa nin reer Turos ah, oo naxaasta
ka shaqayn jiray, Xiiraamna waxaa ka buuxay xigmad, iyo
waxgarasho, iyo sanco uu ku sameeyo shuqul kasta oo
naxaas laga qabto. Oo Boqor Sulaymaan buu u yimid oo
shuqulkiisii oo dhan u sameeyey. **15** Wuxuu sameeyey
labada tiir oo naxaasta ah, oo midkiiba sarajooggiisu yahay
siddeed iyo toban dhudhun; meeriskiisuna yahay laba iyo
toban dhudhun markii xadhig lagu qiyaaso. **16** Wuxuuna
sameeyey laba taaj oo naxaas la shubay ah in la saaro
tiirarkii dhaladooda. Oo taaj sarajooggiisu wuxuu ahaa
shan dhudhun, oo taajka kale sarajooggiisuna wuxuu ahaa
shan dhudhun. **17** Oo taajajka tiirarka dhaladooda saarnaa
waxay lahaayeen shabagyo isa sudhsudhan, iyo silsilado
tidcan, oo taaj wuxuu lahaa toddoba, taajka kalena wuxuu
lahaa toddoba. **18** Oo saasuu u sameeyey tiirarkii; oo
shabaggiiba waxaa kor saarnaa laba saf oo ku wareegsan
inay dedaan taajajka tiirarka kor saaran; oo taajkii kalena
saasoo kaluu u galay. **19** Oo balbalada tiirarkeedii taajajkoodii
saarnaa waxay u ekaayeen ubax, afar dhudhun bayna
ahaayeen. **20** Oo taajajkii labadii tiir saarnaa dushooda oo
shabagga u dhowaana waxay lahaayeen rummaanno. Oo
rummaannadu waxay ahaayeen laba boqol oo taajkiiba
safaf ugu wareegsan. **21** Oo tiirarkiina wuxuu qotomiyey
balbaladii macbudka; oo tiirkii midigta ahaa intuu qotomiyey
ayuu magiciisii u bixiyey Yaakiin, tiirkii bidixda ahaana intuu
qotomiyey ayuu u bixiyey Bocas. **22** Oo tiirarka korkoodana
waxaa saarnaa wax ubax u eg, oo tiirarka hawshoodiina
saasay ku dhammaatay. **23** Oo wuxuu sameeyey berkedda
naxaasta ah, oo labadeeda qar isu jiraan toban dhudhun,
oo ku wada wareegsan, oo sarajooggeeduna wuxuu ahaa
shan dhudhun, oo meeriskeeduna wuxuu ahaa soddon
dhudhun. **24** Oo berkedda qarkeedii wareegsanaa waxaa
ku hoos yiil ubbooyin ku wareegsan berkedda, dhudhunba
toban; oo ubbooyinku waxay ahaayeen laba saf, oo markii
berkeddii la shubay ayaa iyana la shubay. **25** Oo berkeddu
waxay dul saarnayd laba iyo toban dibi, oo saddex waxay u
jeedday xagga woqooyi, saddexna waxay u jeedday xagga
galbeed, saddexna waxay u jeedday xagga koonfureed,
saddexna waxay u jeedday xagga bari; berkeddiina way dul
saarnayd, oo dibidii kulligoodna qarkooda dambe wuxuu
ku jiray gudaha. **26** Oo berkeddii dhumucdeedu waxay
ahayd taako; qarkeedana waxaa loo sameeyey sidii koob
qarkiis oo kale oo ubax u ekaa; oo waxay qaadday laba
kun oo qiyaasood oo bad la yidhaahdo. **27** Oo wuxuu
sameeyey toban saldhig oo naxaas ah, oo saldhig kasta
dhererkiisu wuxuu ahaa afar dhudhun, ballaadhkiisuna

wuxuu ahaa afar dhudhun, sarajooggiisuna wuxuu ahaa
saddex dhudhun. 28 Oo saldhigyadana sidan baa loo
sameeyey; darfaha dhexdooda waxay ku lahaayeen meelo
dhexe. 29 Oo darfaha meelaha u dhexeeyeyna waxaa ku yiil
libaaxyo, iyo dibiyo, iyo keruubiim, oo darfaha korkoodana
waxaa ku yiil meel la saaro; oo libaaxyada iyo dibiyada
hoostoodana waxaa ku yiil ubaxyo ka soo laalaada. 30
Oo saldhig kastaaba wuxuu lahaa afar giraangirood oo
naxaas ah, iyo ulo naxaas ah oo giraangiraha wareejiya;
oo afarta rukunna waxay ku lahaayeen meelo haya; oo
berkeddii hoosteeda ayaa meelihii hayay oo shubanu ku
yiilleen iyagoo dhinac kasta ku leh ubaxyo ka laalaada. 31
Oo afkeeda oo qarka ku dhex jira wuxuu ahaa dhudhun;
oo afkeeduna wuu wareegsanaa, oo wuxuu u ekaa sida
meesha haysa, wuxuuna ahaa dhudhun iyo badh; oo weliba
afkeedu waa xardhanaa oo darfahooduna afargees bay
ahaayeen oo ma wareegsanayn. 32 Oo afarta giraangiroodna
waxay ku yiilleen darfaha hoostooda, oo ulaha giraangiraha
wareejiyaana waxay ku yiilleen salka hoose; oo giraangir
kastana sarajooggeedu wuxuu ahaa dhudhun iyo badh.
33 Oo giraangiruhuna waxay u ekaayeen sidii gaadhifaras
giraangirihiis; oo ulahooda wareejiya, iyo qararkooda, iyo
birahooda gudban, iyo dhexbadhtanadoodaba kulligood shub
bay ahaayeen. 34 Oo afarta geesna waxay ku lahaayeen
afar meelood oo haya, oo afarta meelood oo hayaana
waxay ka mid ahaayeen saldhigga qudhiisii. 35 Oo saldhigga
dushiisana waxaa tiil meel wareegsan oo sarajooggeedu
yahay dhudhun badhkiis; oo saldhigga korkiisa siddooyinkiisa
iyo darfihiisuba isagay ku yiilleen. 36 Oo siddooyinkiisa
iyo darfihiisa dushooda wuxuu ku xardhay keruubiim, iyo
libaaxyo, iyo geedo timireed sidii mid kasta meeshiisii
bannaanayd ahayd, iyagoo mid kasta ubaxyo laalaada
ku wareegsan yihiin. 37 Oo tobankii saldhigna saasuu u
sameeyey; oo kulligoodna isku si baa loo shubay, oo isku
qiyaas bay ahaayeen iyo isku qaab. 38 Oo wuxuu sameeyey
toban berkedood oo naxaas ah; oo berkedba waxay qaadday
afartan bad; oo berked kastaaba waxay ahayd afar dhudhun;
oo tobankii saldhigna mid kasta berked baa saarnayd. 39
Oo saldhigyadii shanna wuxuu dhigay guriga dhankiisa
midig, shantii kalena wuxuu dhigay guriga dhankiisa bidix;
oo berkeddii weynaydna wuxuu dhigay guriga dhankiisa
midig ee xagga bari ee dhinaca koonfureed. 40 Oo Xiiraam
wuxuu wada sameeyey berkedihii, iyo majarafadihii, iyo
maddiibadihii. Oo sidaasuu Xiiraam u dhammeeyey shuqulkii
uu Boqor Sulaymaan ugu sameeyey guriga Rabbiga, 41
kaasoo ahaa labadii tiir, iyo labadii fijaan oo taajajkii tiirarka
kor saarnaa, iyo labadii shabag oo ku dednaa labada
fijaan oo taajajkii tiirarka kor saarnaa, 42 iyo afartii boqol
oo rummaan ee labadii shabag lahaayeen, oo shabag
kastaa wuxuu lahaa laba saf oo rummaan ah si ay u
dedaan labadii fijaan ee taajajkii tiirarka kor saarnaa; 43 iyo
tobankii saldhig, iyo tobankii berkedood ee saldhigyada dul
saarnaa, 44 iyo berkeddii weynayd, iyo laba iyo tobankii
dibi ee berkedda weyn ka hooseeyey, 45 iyo dheryihii, iyo
majarafadihii, iyo maddiibadihii; oo dhammaan weelashan
gurigii Rabbiga yiil ee uu Xiiraam Boqor Sulaymaan u
sameeyey waxay ahaayeen naxaas dhalaasha. 46 Oo
boqorku wuxuu alaabtaas ku shubay Bannaankii Webi Urdun
oo dhoobada lahaa ee u dhexeeyey Sukod iyo Saaretaan.
47 Oo Sulaymaanna weelashii oo dhan ma uu miisaamin,
maxaa yeelay, aad iyo aad bay u badnaayeen; oo naxaasta
miisaankeeda lama hubin. 48 Oo Sulaymaan baa sameeyey
alaabtii guriga Rabbiga tiil oo dhan, kuwaasoo ahaa girgirihii
dahabka ahaa, iyo miiskii ay kibistii tusniinta saarnayd oo
dahabka ahaa; 49 iyo laambadihii ahaa dahabka saafiga ah
oo meesha ugu quduusan horteeda yiil, ee shanu midigta
ka tiil, shanuna bidixda, iyo ubaxyadii iyo laambadihii, iyo
birqaabyadii ee dahabka wada ahaa; 50 iyo koobabkii, iyo
alaabta laambadihii lagu safeeya, iyo maddiibadihii, iyo
malgacadihii, iyo idammadii ee dahabka saafiga ah wada
ahaa, iyo birihii albaabbada guriga hoose ee ah meesha
ugu wada quduusan iyo guriga macbudka ah albaabbadiisa
oo dhan ee dahabka wada ah. 51 Oo saasuu ku wada
dhammaaday shuqulkii uu Boqor Sulaymaan ku sameeyey
guriga Rabbiga. Oo Sulaymaanna wuxuu soo geliyey alaabtii
aabbihiis Daa'uud quduuska ka dhigay ee ahayd lacagtii, iyo
dahabkii, iyo weelashii, oo wuxuu ku riday khasnadihii guriga
Rabbiga.

8 Markaasaa Boqor Sulaymaan wuxuu Yeruusaalem isugu
soo shiriyey odayaashii reer binu Israa'iil, iyo qabiilooyinka
madaxdoodii oo dhan, oo ahaa amiirradii jilibyadii reer binu
Israa'iil inay sanduuqii axdiga Rabbiga ka soo qaadaan
magaaladii Daa'uud oo Siyoon ahayd. 2 Oo raggii reer
binu Israa'iil oo dhammu waxay u soo shireen Boqor
Sulaymaan wakhtigii iidda ah bisha toddobaad ee Eetaaniim
la yidhaahdo. 3 Oo odayaashii reer binu Israa'iil oo dhammu
way yimaadeen, markaasay wadaaddadii sanduuqii soo
qaadeen. 4 Oo wadaaddadii iyo kuwii reer Laawi waxay
soo qaadeen sanduuqii Rabbiga, iyo teendhadii shirka, iyo
kulli weelashii quduuska ahaa oo teendhada ku jiray oo
dhan. 5 Oo Boqor Sulaymaan iyo shirkii reer binu Israa'iil
oo isaga u soo ururay oo dhammu waxay wada joogeen
sanduuqii hortiisa, iyagoo ku allabaryaya ido iyo dibi aan

la sheegi karin ama aan farahooda la tirin karin. **6** Oo
wadaaddadiina sanduuqii axdiga Rabbiga ayay meeshiisii
keeneen, oo waxay soo geliyeen guriga qolkiisii quduuska
ahaa oo ahaa meeshii ugu wada quduusnayd, taasoo ah
keruubiimta baalashooda hoostooda. **7** Waayo, keruubiimtu
baalashoodii way ku kor fidiyeen meeshii sanduuqa, oo
ku qariyeen sanduuqii iyo ulihiisiiba. **8** Oo uluhuna aad
bay u dhaadheeraayeen, sidaas daraaddeed dabadooda
waxaa laga arkay meesha quduuska ah oo ka horraysa
meesha ugu wada quduusan, laakiinse dibadda kama ay
muuqan; oo halkaasay yaallaan ilaa maantadan. **9** Oo
sanduuqiina waxba kuma jirin labadii loox ee dhagaxa
ahayd oo Muuse isagoo Xoreeb jooga ku riday, markii
Rabbigu axdiga la dhigtay reer binu Israa'iil ee ay dalkii
Masar ka soo baxeen mooyaane. **10** Oo kolkii wadaaddadii
ka soo baxeen meeshii quduuska ahayd ayaa daruurtii
ka buuxsantay gurigii Rabbiga, **11** oo sidaas daraaddeed
wadaaddadii way taagnaan kari waayeen inay adeegaan
daruurtii aawadeed; waayo, Rabbiga ammaantiisii ayaa
ka buuxsantay gurigii Rabbiga. **12** Markaasaa Sulaymaan
hadlay oo yidhi, Rabbiyow, waxaad sheegtay inaad gudcurka
qarada weyn dhex degganaanayso. **13** Hubaal waxaan
kuu dhisay guri rug kuu ah, oo ah meel aad weligaa
degganaanayso. **14** Markaasaa boqorkii soo jeestay, oo
shirkii reer binu Israa'iil oo dhan u duceeyey, shirkii reer
binu Israa'iilna way wada istaageen. **15** Markaasuu yidhi,
Mahad waxaa leh Rabbiga ah Ilaaha reer binu Israa'iil, oo
afkiisa kula hadlay aabbahay Daa'uud, oo gacantiisa ku
oofiyey isagoo leh, **16** Tan iyo maalintii aan dadkayga reer
binu Israa'iil ka soo bixiyey dalkii Masar, qabiilooyinka reer
binu Israa'iil oo dhan kama aan dooran magaalo guri la iiga
dhiso si magacaygu halkaas ugu jiro, laakiinse Daa'uud
baan u doortay inuu dadkayga reer binu Israa'iil u taliyo. **17**
Haddaba aabbahay waxaa qalbigiisa ku jiray inuu guri u dhiso
magaca Rabbiga ah Ilaaha reer binu Israa'iil. **18** Laakiinse
Rabbigu wuxuu aabbahay Daa'uud ku yidhi, Qalbigaaga
waxaa ku jiray inaad guri u dhisto magacayga aawadiis, oo
taasu hadday qalbigaaga ku jirtay waad ku hagaagsanayd.
**19** Habase yeeshee adigu guri ii dhisi maysid, laakiinse
wiilkaaga kaa soo bixi doona ayaa magacayga gurigii u
dhisi doona. **20** Oo Rabbigu wuu adkeeyey eraygiisii uu ku
hadlay; waayo, meeshii aabbahay Daa'uud anigaa fuulay,
oo waxaan ku fadhiistay carshigii reer binu Israa'iil, sidii
Rabbigu ballanqaaday; oo gurigii baan u dhisay Rabbiga
ah Ilaaha reer binu Israa'iil magiciisa. **21** Oo halkaasna
meel baan uga sameeyey sanduuqii uu ku jiray axdigii
Rabbiga ee uu awowayaasheen la dhigtay markuu ka soo
bixiyey dalkii Masar. **22** Markaasaa Sulaymaan hor istaagay
meeshii allabariga ee Rabbiga iyadoo ay wada joogaan
shirkii reer binu Israa'iil oo dhammu, oo intuu gacmihiisii
xagga samada u kala bixiyey, **23** ayuu yidhi, Rabbiyow,
Ilaaha reer binu Israa'iilow, Ilaah kula mid ahu kuma jiro
samada sare ama dhulka hoose toona, adoo axdiga xajiyaa
oo u naxariistaa addoommadaada hortaada ku socda oo
kugu aamina qalbigooda oo dhan. **24** Waad xajisay wixii aad
u ballanqaadday aabbahay Daa'uud oo addoonkaagii ahaa;
run ahaan afkaagaad kaga hadashay oo gacantaadana
waad ku oofisay siday maantadan tahay. **25** Haddaba sidaas
daraaddeed, Rabbiyow, Ilaaha reer binu Israa'iilow, xaji wixii
aad u ballanqaadday aabbahay Daa'uud oo addoonkaagii
ahaa, adoo ku leh, Hortayda laga waayi maayo nin carshiga
reer binu Israa'iil ku fadhiista, hadday carruurtaadu isjiraan,
oo ay hortayda ugu socdaan sidaad hortayda ugu socotay
oo kale. **26** Haddaba sidaas daraaddeed, Ilaaha reer
binu Israa'iilow, waan ku baryayaaye eraygaagii aad kula
hadashay aabbahay Daa'uud oo addoonkaagii ahaa ha
rumoobo. **27** Haddaba ma dhab baa in Ilaah dhulka
degganaan doono? Xataa samada iyo samada samooyinku
kuma qaadi karaan, haddaba bal gurigan aan dhisay sidee
buu kuu qaadi karaa! **28** Oo weliba Rabbiyow, Ilaahayow,
aqbal tukashadayda iyo baryootankayga anoo addoonkaaga
ah, oo maqal qaylada iyo tukashada anoo addoonkaaga ahu
aan maanta hortaada ku tukanayo, **29** in indhahaagu ay
habeen iyo maalinba la jiraan gurigan oo ah meeshii aad
tidhi, Magacaygu halkaasuu ku jiri doonaa, si aad u maqashid
tukashadayda anoo addoonkaaga ah oo aan meeshan
xaggeeda u soo tukanayo. **30** Bal maqal baryootankayga
anoo addoonkaaga ah, iyo kan dadkaaga reer binu Israa'iil
markaannu meeshan xaggeeda u soo tukanayno, kaas ka
maqal samada oo ah meeshaad deggan tahay, oo markaad
maqashid na cafi. **31** Haddii nin deriskiisa ku dembaabo,
oo dhaar la saaro oo la dhaariyo, oo intuu yimaado uu ku
hor dhaarto meeshaada allabariga ee gurigan taal, **32** de
markaa samada ka maqal oo yeel, oo addoommadaada
xukun adigoo kii shar leh ciqaabaya si aad xumaantii
jidkiisa madaxa ugu saartid, oo aad kii xaq ahna xaq uga
dhigtid, oo aad ugu abaalguddid sida xaqnimadiisu tahay.
**33** Oo haddii dadkaaga reer binu Israa'iil cadowgoodu uu
u laayo dembigii ay kugu dembaabeen aawadiis, oo ay
soo noqdaan, oo magacaaga qirtaan, oo tukadaan, oo
gurigan kugu baryaan, **34** de markaas samada ka maqal oo
dembiga dadkaaga reer binu Israa'iil ka cafi, oo iyaga ku
soo celi dalkii aad awowayaashood siisay. **35** Oo hadday
kugu dembaabaan, oo aad sidaas aawadeed samada uga

xidho, oo roob la waayo, oo ay meeshan xaggeeda u soo
tukadaan, oo magacaaga qirtaan, oo dembigoodii ka soo
noqdaan markaad dhibtid, 36 de markaas samada ka maqal,
oo dembiga ka cafi addoommadaada iyo dadkaaga reer
binu Israa'iil, markaad bartid jidka wanaagsan ee waajibka
ku ah inay ku socdaan, oo roob u soo dir dalkaaga aad
dadkaaga dhaxal ahaan u siisay. 37 Oo hadday dalka
ka dhacaan abaar, ama belaayo cudur ah, ama beera-
engeeg, ama caariyaysi, ama ayax, ama diir, ama haddii
cadowgoodu ku hareereeyo dalkooda magaalooyinkiisa,
belaayo kasta iyo cudur kastaba ha ahaadee, 38 kolkaas
haddii nin kastaaba amase dadka reer binu Israa'iil oo
dhammu ay tukadaan oo baryootamaan oo nin kastaaba
ogaado belaayada qalbigiisa ku jirta, oo uu gacmaha u
soo fidiyo gurigan xaggiisa, 39 de markaas samada oo ah
meeshaad deggan tahay ka maqal, oo iyaga cafi, oo yeel,
oo nin walba ugu abaalgud siday jidadkiisa oo dhammu
yihiin, adoo qalbigiisa og, (maxaa yeelay, adigoo keliya ayaa
garta waxa binu-aadmiga oo dhan qalbiyadooda ku jira; ) 40
inay kaa cabsadaan cimrigooda oo dhan intay ku nool yihiin
dalkii aad awowayaashayo siisay. 41 Oo weliba shisheeyaha
aan dadkaaga reer binu Israa'iil ahaynna, hadduu dal fog
uga yimaado magacaaga aawadiis, 42 (waayo, waxay
maqli doonaan magacaaga weyn, iyo gacantaada xoogga
badan, iyo cududdaada fidsan) markuu yimaado oo uu u
soo tukado gurigan xaggiisa, 43 de markaas samada oo ah
meeshaad deggan tahay ka maqal, oo shisheeyaha u yeel
wixii uu ku weyddiisto oo dhan, in dadka dunida jooga oo
dhammu ay magacaaga ogaadaan, oo ay kaa cabsadaan
sida dadkaaga reer binu Israa'iil oo kale, iyo inay ogaadaan in
gurigan aan dhisay magacaaga loogu yeedho. 44 Oo hadday
dadkaagu dagaal u baxaan inay la diriraan cadowgooda, oo
ay maraan jidkii aad ku soo dirtay, oo ay ku baryaan oo u
soo tukadaan xagga magaaladii aad dooratay iyo xagga
gurigii aan magacaaga u dhisay, 45 de markaas samada ka
maqal tukashadooda iyo baryootankooda, dacwaddoodana
u yeel. 46 Haddii ay kugu dembaabaan, waayo, nin aan
dembaabinu ma jiro, oo aad u cadhootid, oo aad markaas
cadowga u gacangelisid inay la tagaan oo maxaabiis ahaan
ugu kaxaystaan cadowga dalkiisii, ama ha dhowaado ama ha
dheeraadee; 47 oo weliba hadday ku fikiraan dalkii maxaabiis
ahaanta loogu kaxaystay, oo ay kuu soo noqdaan, oo ay
kugu baryaan dalkii kuwii maxaabiisahaanta u kaxaystay, ee
ay yidhaahdaan, Waannu dembaabnay, oo wax qalloocan
baannu samaynay, oo si shar ah ayaannu u macaamiloonnay,
48 oo hadday kuugu soo noqdaan qalbigooda oo dhan iyo
naftooda oo dhan intay joogaan dalka cadaawayaashoodii
maxaabiis ahaanta u kaxaystay, oo ay ku baryaan oo u soo
tukadaan xagga dalkoodii aad mar hore awowayaashood
siisay, iyo xagga magaaladii aad dooratay, iyo xagga
gurigii aan magacaaga u dhisay, 49 markaas tukashadooda
iyo baryootankooda ka maqal samada oo ah meeshaad
deggan tahay, dacwaddoodana u yeel; 50 oo cafi dadkaaga
kugu dembaabay, oo ka saamax xadgudubyadooda ay
kugu xadgudbeen oo dhan; oo kuwii maxaabiis ahaanta u
kaxaystay raxmad geli si ay ugu naxariistaan, 51 maxaa
yeelay, iyagu waa dadkaagii iyo dhaxalkaagii aad ka soo
bixisay dalkii Masar iyo foornadii birta dhexdeeda; 52 oo
dhegahaagu ha maqleen baryootanka addoonkaaga iyo
baryootanka dadkaaga reer binu Israa'iil si aad u maqashid
mar alla markay kuu qayshadaanba, 53 waayo, Sayidow,
Rabbiyow, iyagaad uga soocatay dadkii dunida oo dhan inay
ahaadaan dhaxalkaagii, siduu ahaa eraygaagii aad u soo
dhiibtay addoonkaagii Muuse, markaad awowayaashayo
ka soo bixisay dalkii Masar. 54 Oo markii Sulaymaan
dhammeeyey tukashadan iyo baryootankan uu Rabbiga
baryay oo dhan ayuu ka kacay meeshii Rabbiga allabariga
loogu bixin jiray horteeda iyo jilbajooggii uu jilbo joogay
isagoo gacmaha xagga samada u fidinaya. 55 Markaasuu
istaagay oo shirkii reer binu Israa'iil oo dhan cod weyn ugu
duceeyey, oo yidhi, 56 Waxaa mahad leh Rabbiga nasiyey
dadkiisa reer binu Israa'iil siduu ugu ballanqaaday oo dhan,
oo wixii uu u ballanqaaday oo dhan eray keliya kama baaqan
ballankiisii wanaagsanaa oo dhan, ee uu ugu ballanqaaday
addoonkiisii Muuse. 57 Rabbiga Ilaaheenna ahu ha inoola
jiro, siduu ula jiray awowayaasheen oo kale; oo yuusan
inaga tegin, oo ina dayrin; 58 si uu qalbiyadeenna xaggiisa
ugu jeediyo inaynu ku soconno jidadkiisa oo dhan, oo aynu
xajinno amarradiisa iyo qaynuunnadiisa iyo xukummadiisa uu
awowayaasheen ku amray. 59 Oo erayadaydan aan Rabbiga
hortiisa ku baryay, habeen iyo maalinba ha gaadheen
Rabbiga Ilaaheenna ah, si uu u yeelo dacwaddayda anoo
addoonkiisa ah iyo dacwadda dadkiisa reer binu Israa'iil,
sida maalin walba laga doonayo, 60 si ay dadka dunida
jooga oo dhammu u ogaadaan in Rabbigu Ilaah yahay oo
aan mid kale jirin. 61 Sidaas daraaddeed qalbigiinnu ha u
qummanaado Rabbiga Ilaaheenna ah, inaad qaynuunnadiisa
ku socotaan oo aad amarradiisa xajisaan sida maanta
oo kale. 62 Markaas boqorkii iyo reer binu Israa'iil oo
dhammaantood la jira ayaa allabari Rabbiga hortiisa ku
bixiyey. 63 Oo Sulaymaan qurbaannada nabaadiinada ee uu
Rabbiga u bixiyey waxay ahaayeen laba iyo labaatan kun
oo dibi, iyo boqol iyo labaatan kun oo ido ah. Oo sidaasay
boqorkii iyo reer binu Israa'iil oo dhammuba gooni uga

dhigeen gurigii Rabbiga. **64** Oo isla maalintaasuu boqorku
quduus ka dhigay barxaddii ka horraysay guriga Rabbiga
dhexdeeda, waayo, halkaas wuxuu ku bixiyey qurbaanka la
gubo, iyo qurbaanka hadhuudhka, iyo baruurtii qurbaannada
nabaadiinada; maxaa yeelay, meeshii allabariga oo naxaasta
ahayd ee Rabbiga hor tiil way ku yarayd oo ma wada qaadin
qurbaanka la gubo iyo qurbaanka hadhuudhka iyo baruurtii
qurbaannada nabaadiinada. **65** Oo wakhtigaas Sulaymaan
sidaasuu iiddii u sameeyey iyadoo ay la joogaan reer binu
Israa'iil oo dhammu kuwaasoo ahaa shir weyn, oo waxay ka
yimaadeen meesha Xamaad laga soo galo iyo ilaa durdurka
Masar, oo Rabbiga Ilaaheenna ah hortiisa waxay ku iidayeen
toddoba maalmood iyo toddoba maalmood oo isku ah afar
iyo toban beri. **66** Oo maalintii siddeedaad ayuu dadkii diray,
oo iyana intay boqorkii u duceeyeen ayay teendhooyinkoodii
tageen iyagoo faraxsan oo qalbigoodu kaga rayraynaya
wanaaggii oo dhan oo uu Rabbigu u sameeyey addoonkiisii
Daa'uud iyo dadkiisii reer binu Israa'iilba.

**9** Oo Sulaymaan markuu dhammeeyey dhismihii guriga
Rabbiga, iyo gurigii boqorka, iyo kulli wixii uu damacsanaa
oo uu ku faraxsanaa inuu sameeyo oo dhan, **2** ayaa
Rabbigu Sulaymaan mar labaad u muuqday, siduu markii
hore Gibecoon ugu muuqday oo kale. **3** Oo Rabbigu wuxuu
ku yidhi, Waan maqlay tukashadaadii iyo baryootankaagii
aad hortayda ku samaysay; oo quduus baan ka dhigay
gurigan aad dhistay si magacayga weligiisba halkaas loogu
daayo, oo indhahayga iyo qalbigayguna halkaasay joogi
doonaan weligood iyo weligoodba. **4** Oo adiguna haddaad
sidii aabbahaa Daa'uud oo kale hortayda ugu socotid qalbi
daacad ah iyo qummanaan, si aad u yeeshid wax alla
wixii aan kugu amray oo aad u xajisid qaynuunnadayda
iyo xukummadayda, **5** de markaasaan dhisi doonaa oo
aan weligiis waarin doonaa carshiga boqortooyadaada
ee reer binu Israa'iil u taliya sidaan ugu ballanqaaday
aabbahaa Daa'uud, markaan ku idhi, Nin carshiga dalka
Israa'iil ku fadhiista lagaa waayi maayo. **6** Laakiinse idinka
ama carruurtiinnu haddaad lasocodkayga ka leexataan oo
aydnaan dhawrin amarradayda iyo qaynuunnadayda aan
idin hor dhigay, laakiinse aad intaad tagtaan ilaahyo kale
u adeegtaan oo caabuddaan, **7** de markaasaan reer binu
Israa'iil ka gooyn doonaa dalkii aan siiyey; oo gurigan aan
magacayga aawadiis quduus uga dhigayna hortaydaan
ka tuuri doonaa, oo reer binu Israa'iilna markaas waxay
dadyowga oo dhan ku dhex noqon doonaan maahmaah iyo
halqabsi. **8** Oo in kastoo guriganu dheer yahay, haddana
mid walba oo ag maraaba wuu la yaabi doonaa, oo wuu ku
foodhyi doonaa, oo wuxuu odhan doonaa, Rabbigu muxuu
sidan uga dhigay dalkan iyo gurigan? **9** Oo waxaa lagu
jawaabi doonaa, Waxay ka tageen Rabbigii Ilaahood ahaa
oo awowayaashood ka soo bixiyey dalkii Masar, oo waxay
raaceen ilaahyo kale, wayna caabudeen oo u adeegeen,
oo sidaas daraaddeed baa Rabbigu xumaantan oo dhan
ugu soo dejiyey. **10** Oo markay dhammaadeen labaatankii
sannadood ee uu Sulaymaan labadii guri dhisayay, kuwaasoo
ahaa gurigii Rabbiga iyo gurigii boqorka, **11** ayuu Boqor
Sulaymaan Xiiraam siiyey labaatan magaalo oo ku tiil
dalkii Galili. (Maxaa yeelay, Xiiraam oo ahaa boqorkii Turos
wuxuu Sulaymaan siiyey qoryo kedar ah, iyo qoryo beroosh
ah, iyo dahab, in alla intuu doonayay.) **12** Oo Xiiraamna
wuxuu Turos uga soo kacay inuu arko magaalooyinkii
Sulaymaan siiyey, kumana uu farxin. **13** Markaasuu yidhi,
Walaalkayow, magaalooyinkan aad i siisay waa maxay?
Kolkaasuu magaalooyinkii u bixiyey dalkii Kabuul oo ilaa
maantadanna waa la yidhaahdaa. **14** Xiiraamna wuxuu
boqorkii u diray boqol iyo labaatan talanti oo dahab ah.
**15** Oo sababtii uu Sulaymaan shaqaalayaashii u doortay
waxay ahayd inuu dhiso gurigii Rabbiga, iyo gurigii uu isagu
lahaa, iyo Millo, iyo derbigii Yeruusaalem, iyo Xaasoor, iyo
Megiddoo, iyo Geser. **16** Waayo, Fircoon oo ahaa boqorkii
Masar mar horuu tegey oo Geser qabsaday oo gubay, oo
wuxuu laayay dadkii reer Kancaan oo magaalada degganaa,
oo qayb ahaan ayuu u siiyey gabadhiisii Sulaymaan u
dhaxday. **17** Markaasaa Sulaymaan dhisay Geser, iyo
Beytxooroontii hoose, **18** iyo Bacalad, iyo Taamaar oo ku
dhex tiil cidladii dalka, **19** iyo magaalooyinkii wax lagu kaydin
jiray ee uu Sulaymaan lahaa oo dhan, iyo magaalooyinkii
gaadhifardoodkiisa, iyo magaalooyinkii fardooleydiisa, iyo
wixii uu Sulaymaan jeclaaday inuu ka dhisto Yeruusaalem
iyo Lubnaan, iyo dalkii uu boqorka ka ahaa oo dhan. **20** Oo
weliba dadkii ka hadhay reer Amor, iyo reer Xeed, iyo reer
Feris, iyo reer Xiwi, iyo reer Yebuus, oo aan reer binu Israa'iil
ahayn, **21** kuwaas farcankoodii dalka ku hadhay oo anay
reer binu Israa'iil karin inay wada baabbi'iyaan, Sulaymaan
wuxuu ka dhigtay addoommo ilaa maantadan la joogo. **22**
Laakiinse reer binu Israa'iil Sulaymaan addoommo kama
dhigan, waxayse ahaayeen raggii dagaalyahannada ahaa,
iyo midiidinnadiisii, iyo amiirradiisii, iyo saraakiishiisii, iyo
taliyayaashii gaadhifardoodkiisa, iyo fardooleydiisaba. **23**
Kuwanu waxay ahaayeen saraakiishii Sulaymaan hawshiisa
u talin jiray oo ahaa shan boqol iyo konton nin oo u taliya
dadka hawsha qabta. **24** Laakiinse gabadhii Fircoon waxay
ka soo baxday magaaladii Daa'uud, oo gashay gurigeedii
uu Sulaymaan iyada u dhisay; markaasuu haddana wuxuu

dhisay Millo. 25 Oo sannaddiiba saddex jeer ayuu Sulaymaan
meeshii allabariga oo uu Rabbiga u dhisay ku bixin jiray
qurbaanno la gubo, iyo qurbaanno nabaadiino, oo girgirihii
Rabbiga hor yiilna wuxuu ku gubi jiray foox, oo saasuu
gurigii ku dhammeeyey. 26 Markaasaa Boqor Sulaymaan
doonniyo ku sameeyey Cesyoon Geber taasoo ku taal
Eelood dhinaceeda ee ah xeebta Badda Cas ee ku taal
dalka Edom. 27 Oo Xiiraamna wuxuu doonniyihii raaciyey
addoommadiisii baxriyiinta ahaa oo badda aqoonta u lahaa,
oo waxaa wada jiray iyaga iyo addoommadii Sulaymaan. 28
Waxayna yimaadeen Oofir, oo halkaasay Boqor Sulaymaan
uga keeneen afar boqol iyo labaatan talanti oo dahab ah.

**10** Boqoraddii Shebaa markay maqashay Sulaymaan
warkiisii ku saabsanaa xagga magaca Rabbiga ayay
ugu timid inay ku imtixaanto su'aalo adadag. 2 Oo waxay
Yeruusaalem la timid dad aad u badan, iyo awr badan oo ay
ku raran yihiin uunsi, iyo dahab aad u badan, iyo dhagaxyo
qaali ah; oo markay Sulaymaan u timid wixii qalbigeeda
ku jiray oo dhan ayay kala hadashay. 3 Sulaymaanna
wuxuu uga jawaabay su'aalaheedii oo dhan; oo wax boqorka
ka qarsoonaa oo uusan u sheegin ma jirin. 4 Boqoraddii
Shebaana markay aragtay xigmaddii Sulaymaan oo dhan,
iyo gurigii uu dhisay, 5 iyo cuntadii miiskiisa, iyo fadhigii
addoommadiisa, iyo hawshii adeegayaashiisa, iyo dharkoodii,
iyo kuwiisii cabniinka siin jiray, iyo wixii uu guriga Rabbiga
ku fuuli jiray, naf dambe iyadii kuma hadhin. 6 Markaasay
boqorkii ku tidhi, Warkii aan dalkaygii ku maqlay ee ku
saabsanaa falimahaaga iyo xigmaddaadu run buu ahaa.
7 Habase yeeshee erayadaas ma aan rumaysan jeeraan
imid oo ay indhahaygu arkeen; oo weliba badhna la iima
sheegin. Xigmaddaada iyo barwaaqadaadu way ka sii badan
yihiin warkii aan maqlay. 8 Waxaa faraxsan raggaaga, oo
waxaa faraxsan addoommadaadan had iyo goorba hortaada
taagan oo xigmaddaadana maqla. 9 Waxaa mahad leh
Rabbiga Ilaahaaga ah oo kugu farxay inuu kugu fadhiisiyo
carshiga reer binu Israa'iil. Rabbigu weligiisba wuu jeclaaday
reer binu Israa'iil, oo sidaas aawadeed ayuu boqor kaaga
dhigay inaad samaysid xukun iyo caddaalad. 10 Markaasay
boqorkii siisay boqol iyo labaatan talanti oo dahab ah, iyo
uunsi faro badan, iyo dhagaxyo qaali ah; uma iman uunsi
dambe oo u badan sidii kii boqoradda Shebaa ay siisay
Boqor Sulaymaan. 11 Oo Xiiraam doonniyihiisii Oofir dahab
ka keenay, waxay kaloo Oofir ka keeneen geedo almuug ah
oo badan, iyo dhagaxyo qaali ah. 12 Oo boqorkiina geedihii
almuugga ahaa ayuu tiirar uga dhigay gurigii Rabbiga, iyo
gurigii boqorka, oo wuxuu kaloo nimankii gabayaaga ahaa
uga sameeyey kataarado iyo shareerado; oo ilaa maantadan
la joogo geedo almuug ah oo kuwaas oo kale ah ma iman,
lamana arkin. 13 Oo Boqor Sulaymaanna wuxuu boqoraddii
Shebaa siiyey wax alla wixii ay doonaysay oo dhan oo ay
weyddiisatay, oo ayan ku jirin wixii uu Sulaymaan u siiyey
sharafta boqornimadiisa, markaasay noqotay oo dalkeedii
tagtay iyadii iyo addoommadeediiba. 14 Haddaba dahabkii
sannad kasta Sulaymaan u iman jiray miisaankiisu wuxuu
ahaa lix boqol iyo lix iyo lixdan talanti oo dahab ah, 15
oo intaasuna kuma jirin wixii ay keeni jireen geddisleyda
iyo baayacmushtariyaasha, iyo boqorradii dalka Carabta
oo dhan, iyo taliyayaashii waddanka. 16 Markaasaa Boqor
Sulaymaan wuxuu sameeyey laba boqol oo gaashaan
waaweyn oo dahab la tumay ah; oo gaashaan weynba
waxaa galay lix boqol oo sheqel oo dahab ah. 17 Oo haddana
wuxuu kaloo sameeyey saddex boqol oo gaashaan oo yaryar
oo dahab la tumay ah, oo gaashaan yarba waxaa galay
saddex mina oo dahab ah, markaasaa boqorku iyagii dhigay
gurigii ku yiil kaynta Lubnaan. 18 Oo weliba boqorku wuxuu
kaloo sameeyey carshi weyn oo foolmaroodi ah, oo wuxuu
ku dahaadhay dahabkii ugu fiicnaa. 19 Carshigu wuxuu
lahaa jaranjaro lix tallaabo ah, oo carshiga xaggiisa sare ee
dambena way wareegsanayd; oo kursiga meeshiisa lagu
fadhiisto labadeeda dhinacba waxay lahayd meelo xusullada
la saarto, oo meelaha xusullada la saartana dhinacooda
waxaa taagnaa laba libaax. 20 Oo jaranjaradii lixdeedii
tallaabo labadooda dhinac waxaa ka taagnaa laba iyo toban
libaax; oo boqortooyana saas oo kale looguma samayn.
21 Oo Boqor Sulaymaan weelashiisii wax lagu cabbi jiray
oo dhammu waxay wada ahaayeen dahab; gurigii kaynta
Lubnaan weelashiisii oo dhammuna waxay wada ahaayeen
dahab saafi ah, oo midna lagama samayn lacag, waayo,
wakhtigii Sulaymaan lacag waxba qiimo ma lahayn. 22 Maxaa
yeelay, boqorku wuxuu badda ku lahaa doonniyo Tarshiish u
dhoofa oo ay la jiraan Xiiraam doonniyihiisa; oo saddexdii
sannadoodba mar bay doonniyihii Tarshiish iman jireen, oo
waxay keeni jireen dahab, iyo lacag, iyo foolmaroodi, iyo
daayeerro, iyo daa'uusyo. 23 Sidaasuu Boqor Sulaymaan
xagga maalka iyo xagga xigmaddaba ugaga hor maray
boqorradii dunida oo dhan. 24 Oo dunida oo dhammuna
waxay doondooneen Sulaymaan inay arkaan oo ay maqlaan
xigmaddii Ilaah qalbigiisa geliyey. 25 Oo nin waluba wuxuu
sannad kasta u keeni jiray hadiyaddiis oo ay ka mid yihiin
weelal lacag ah, iyo weelal dahab ah, iyo dhar, iyo hub, iyo
uunsi, iyo fardo, iyo baqlo. 26 Sulaymaanna wuxuu urursaday
gaadhifardood iyo rag fardooley ah; oo wuxuu lahaa kun
iyo afar boqol oo gaadhifaras, iyo laba iyo toban kun oo

nin oo fardooley ah, oo wuxuu fadhiisiyey magaalooyinkii
gaadhifardoodka, oo qaarna boqorkay Yeruusaalem la
joogeen. **27** Oo boqorku wuxuu lacag Yeruusaalem kaga
dhigay sida dhagaxyo oo kale, oo geedo kedar ahna wuxuu
u soo badiyey oo ka dhigay sida geedaha darayga ah
oo dhulka hoose ka baxa oo kale. **28** Fardihii Sulaymaan
haystayna waxaa laga keenay dalka Masar, oo boqorka
baayacmushtariyaashiisii ayaa raxan raxan u soo kaxeeyey,
iyagoo raxanba iib gaar ah siiyey. **29** Oo gaadhifaras wuxuu
Masar kaga soo bixi jiray lix boqol oo sheqel oo lacag ah,
farasna boqol iyo konton sheqel; oo saasoo kalay ugu wada
keeni jireen boqorradii reer Xeed oo dhan iyo boqorradii reer
Suuriyaba.

**11** Oo Boqor Sulaymaan wuxuu jeclaaday naago badan
oo qalaad, oo aan gabadhii Fircoon ahayn, naagahaas
oo ahaa reer Moo'aab, iyo reer Cammoon, iyo reer Edom, iyo
reer Siidoon, iyo reer Xeed. **2** Oo quruumahaasuna waxay
ahaayeen kuwii Rabbigu reer binu Israa'iil ku yidhi, Idinku ha
dhex gelina, iyana yaanay idin soo dhex gelin, waayo, hubaal
qalbiyadiinna waxay u jeedinayaan xagga ilaahyadooda;
oo Sulaymaan kuwaasuu caashaq u qabtay. **3** Oo wuxuu
lahaa toddoba boqol oo naagood oo marwooyin ah, iyo
saddex boqol oo naagood oo addoommo ah; oo naagihiisiina
qalbigiisii way sii jeediyeen. **4** Oo markii Sulaymaan gaboobay
ayaa naagihiisii qalbigiisii u jeediyeen ilaahyo kale xaggood;
oo qalbigiisuna kuma qummanayn xagga Rabbiga Ilaahiisa
ahaa sidii qalbigii aabbihiis Daa'uud ahaa oo kale. **5** Waayo,
Sulaymaan wuxuu raacay Cashtored oo ahayd ilaahaddii reer
Siidoon, iyo Milkom oo ahaa karaahiyadii ay reer Cammoon
caabudi jireen. **6** Oo Sulaymaan wuxuu sameeyey wax
Rabbiga hortiisa shar ku ah, oo dhammaantiis ma uu raacin
Rabbiga sidii aabbihii Daa'uud. **7** Markaasaa Sulaymaan
wuxuu meel sare uga dhisay buurtii Yeruusaalem ku hor tiil
Kemoosh oo ahaa karaahiyadii reer Moo'aab, iyo Molokh
oo ahaa karaahiyadii reer Cammoon. **8** Oo sidaasuu ugu
wada sameeyey naagihiisii qalaadaa oo dhan kuwaasoo
uunsi u shidi jiray, allabarina u bixin jiray ilaahyadooda. **9**
Oo Rabbigu Sulaymaan buu u cadhooday, maxaa yeelay,
qalbigiisii ayaa ka jeestay Rabbiga Ilaaha reer binu Israa'iil
ah, oo isaga labada jeer u muuqday, **10** oo ku amray wax
ku saabsan waxan kuwaasoo ah inuusan raacin ilaahyo
kale; laakiinse isagu ma uu xajin wixii Rabbigu ku amray. **11**
Sidaas daraaddeed Rabbigu wuxuu Sulaymaan ku yidhi,
Waxan aad samaysay aawadiis ayaan boqortooyada kaaga
xoogayaa, oo waxaan siinayaa addoonkaaga, maxaa yeelay,
ma aadan xajin axdigaygii iyo qaynuunnadaydii aan kugu
amray. **12** Habase yeeshee, intaad nooshahay saas yeeli
maayo, aabbahaa Daa'uud aawadiis; laakiinse waxaan ka
xoogayaa wiilkaaga. **13** Oo weliba boqortooyada oo dhan
ka wada xoogi maayo, laakiinse qabiil ayaan wiilkaaga
siinayaa, addoonkayga Daa'uud aawadiis iyo Yeruusaalem
oo aan doortay aawadeed. **14** Markaasaa Rabbigu wuxuu
Sulaymaan ku kiciyey cadow, kaasoo ahaa Hadad oo
reer Edom ahaa, oo ka soo farcamay boqorka Edom. **15**
Markii Daa'uud Edom joogay, oo Yoo'aab oo ahaa sirkaalkii
ciidankuna halkaas u tegey inuu soo aaso dadkii la laayay,
kuwaasoo ahaa wixii lab ahaa ee uu Edom ku wada laayay
oo dhan; **16** (waayo, Yoo'aab iyo reer binu Israa'iil oo
dhammu halkaasay iska joogeen intii lix bilood ah, ilaa
uu wada jaray wixii lab ahaa ee Edom joogay oo dhan;
) **17** waxaa cararay Hadad iyo dhawr reer Edom ah oo
ahaa addoommadii aabbihiis inay tagaan dalka Masar, oo
Hadadna kolkaas weli inan yar buu ahaa. **18** Oo waxay ka
ambabbexeen Midyaan, oo Faaraan tageen; oo rag bay
Faaraan ka sii kaxaysteen, oo waxay yimaadeen dalkii
Masar, kolkaasay u tageen Fircoon oo ahaa boqorkii Masar,
oo isna wuxuu siiyey guri, cuntona joogtuu uga dhigay,
dhulna wuu siiyey. **19** Hadadna raallinimo weyn buu ka helay
Fircoon, oo xataa wuxuu u guuriyey naagtiisii walaasheed,
taasoo la dhalatay boqoraddii Taxfenees. **20** Oo Taxfenees
walaasheed waxay isagii u dhashay wiilkiisii Genubad,
kaasoo ay Taxfenees guriga Fircoon kaga gudhisay, oo
Genubad guriga Fircoon ayuu joogi jiray, isagoo la jooga
Fircoon wiilashiisa. **21** Oo markii Hadad Masar ku maqlay in
Daa'uud dhintay oo la seexday awowayaashiis, Yoo'aab oo
sirkaalkii ciidanka ahaana dhintay ayuu Fircoon ku yidhi, I sii
daa aan dalkaygii tagee. **22** Markaasaa Fircoon ku yidhi, War
intaad ila joogtay maxaad iga weyday oo aad u doonaysaa
inaad dalkaagii tagto? Isna wuxuu ugu jawaabay, Waxba;
laakiinse i sii daa aan tagee. **23** Oo Ilaah haddana wuxuu
ku kiciyey cadow kale, oo kaasuna wuxuu ahaa Resoon
ina Elyaadaac kaasoo ka cararay sayidkiisii Hadadceser
oo boqorkii Soobaah ahaa. **24** Oo rag buu soo urursaday,
guutona sirkaal buu u noqday markii Daa'uud kuwii Soobaah
laayay; oo Dimishaq bay tageen oo halkaasay iska degeen
oo Dimishaq wax ku xukumeen. **25** Oo wakhtigii Sulaymaan
noolaa oo dhan cadow buu u ahaa reer binu Israa'iil, oo
waxaa kaloo wehliyey belaayadii Hadad ku sameeyey; oo
intuu reer binu Israa'iil u karaahsaday ayuu Suuriya boqor u
noqday. **26** Oo waxaa kaloo jiray Yaaraabcaam ina Nebaad
oo ahaa reer Efraad oo Sereedaah degganaa, kaasu wuxuu
ahaa Sulaymaan addoonkiisa, oo hooyadiis magaceeda
waxaa la odhan jiray Seruucaah, waxayna ahayd naag

carmal ah, oo isna gacantuu boqorka u qaaday. 27 Tanu waxa
weeye sababtii uu boqorkii gacanta ugu qaaday: Sulaymaan
wuxuu dhisay Millo, oo uu hagaajiyey dildillaacii magaaladii
aabbihiis Daa'uud. 28 Oo ninkii Yaaraabcaamna wuxuu ahaa
nin xoog leh; markaasaa Sulaymaan wuxuu arkay in ninka
dhallintayaru yahay nin aad u shaqeeya, kolkaasuu madax
uga dhigay hawshii reer Yuusuf oo dhan. 29 Oo waagaas
waxay noqotay, markii Yaaraabcaam Yeruusaalem ka tegey,
inuu Nebi Axiiyaah oo ahaa reer Shiiloh isagii jidka ka helay,
oo Axiiyaahna dhar cusub buu qabay, oo labadooda keliya
ayaa berrin joogay. 30 Markaasaa Axiiyaah qabsaday dharkii
cusbaa oo uu qabay, oo wuxuu u kala jeexjeexay laba
iyo toban meelood. 31 Kolkaasuu Yaaraabcaam ku yidhi,
Toban meelood qaado, waayo, Rabbiga Ilaaha reer binu
Israa'iil ah wuxuu leeyahay, Boqortooyada waan ka xoogayaa
Sulaymaan, oo toban qabiil ayaan ku siinayaa, 32 (laakiinse
qabiil isagaa u haysanaya addoonkaygii Daa'uud aawadiis,
iyo Yeruusaalem oo ah magaaladii aan qabiilooyinka reer
binu Israa'iil oo dhan ka doortay aawadeed; ) 33 maxaa
yeelay, way i dayriyeen, oo waxay caabudeen Cashtored
oo ilaahaddii reer Siidoon ah, iyo Kemoosh oo ah ilaahii
reer Moo'aab, iyo Milkom oo ah ilaahii reer Cammoon;
oo jidadkaygiina kuma ay socon, inay sameeyaan waxa
hortayda ku qumman, iyo inay dhawraan qaynuunnadayda
iyo xukummadayda, sidii aabbihiis Daa'uud yeeli jiray oo kale.
34 Habase yeeshee boqortooyada oo dhan ka wada qaadi
maayo; laakiinse cimrigiisa oo dhan amiir baan ka dhigayaa
addoonkaygii Daa'uud oo aan doortay aawadiis, maxaa
yeelay, wuxuu dhawray amarradaydii iyo qaynuunnadaydii.
35 Laakiinse boqortooyada waxaan ka qaadayaa wiilkiisa
oo adigaan ku siinayaa toban qabiil. 36 Oo wiilkiisana
waxaan siinayaa qabiil keliya in addoonkaygii Daa'uud
had iyo goorba hortayda laambad ku haysto Yeruusaalem
dhexdeeda, taasoo ah magaaladii aan u doortay inaan
magacayga halkaas dhigo. 37 Oo waan ku qaadan doonaa,
oo waxaad boqor u ahaan doontaa siday naftaadu doonayso,
oo dalka Israa'iilna boqor baad ka noqon doontaa. 38
Oo haddaad maqasho waxa aan kugu amro oo dhan,
oo aad jidadkaygana ku socotid, oo aad samaysid waxa
hortayda ku qumman, oo aad dhawrtid qaynuunnadayda
iyo amarradayda, sidii addoonkaygii Daa'uud yeeli jiray
oo kale, ayaan kula jiri doonaa, oo waxaan kuu dhisi
doonaa reer ammaan ah, sidii aan Daa'uud ugu dhisay oo
kale, oo weliba dalka Israa'iilna adigaan ku siinayaa. 39
Oo taas aawadeed Daa'uud farcankiisa waan dhibayaa
laakiinse dhibka ku waarin maayo. 40 Sidaas daraaddeed
Sulaymaan wuxuu damcay inuu Yaaraabcaam dilo; laakiinse
Yaaraabcaam wuu kacay, oo wuxuu u cararay dalka Masar,
oo u tegey Shiishaq oo ahaa boqorkii Masar, oo tan iyo
markii Sulaymaan geeriyooday ayuu dalka Masar iska
joogay. 41 Haddaba Sulaymaan falimihiisii kale iyo wixii uu
sameeyey oo dhan, iyo xigmaddiisiiba, sow kuma qorna
kitaabkii falimaha Sulaymaan? 42 Oo wakhtigii Sulaymaan
reer binu Israa'iil oo dhan Yeruusaalem boqorka ugu ahaa
wuxuu ahaa afartan sannadood. 43 Markaasaa Sulaymaan
dhintay oo la seexday awowayaashiis, oo waxaa lagu aasay
magaaladii aabbihiis Daa'uud; oo wiilkiisii Rexabcaam ayaa
meeshiisii boqor ka noqday.

12 Markaasaa Rexabcaam wuxuu tegey Shekem, maxaa
yeelay, reer binu Israa'iil oo dhammu waxay yimaadeen
Shekem inay isaga ku soo boqraan. 2 Oo markii Yaaraabcaam
ina Nebaad taas maqlay ayaa Yaaraabcaam iyo shirkii
reer binu Israa'iil oo dhammu u yimaadeen, 3 (waayo,
Yaaraabcaam wuxuu weli joogay dalkii Masar oo uu Boqor
Sulaymaan kaga cararay, oo Yaaraabcaamna wuxuu iska
joogay dalka Masar, laakiinse waa loo cid diray oo loo
yeedhay; ) markaasay Rexabcaam la hadleen oo waxay
ku yidhaahdeen, 4 War aabbahaa harqood daran buu na
saaray; haddaba noo fududee hawshii aabbahaa oo adkayd
iyo harqoodkiisii cuslaa oo uu na saaray, annana waannu
kuu adeegaynaa. 5 Markaasuu ku yidhi, Bal intii saddex
maalmood ah iga maqnaada, dabadeedna igu soo noqda.
Markaasaa dadkii ka tegey. 6 Markaasaa Boqor Rexabcaam
la tashaday odayaashii aabbihiis Sulaymaan intuu noolaa hor
joogi jiray, oo wuxuu ku yidhi, War maxaad igula talinaysaan
oo aan dadkan jawaab ugu celiyaa? 7 Oo intay la hadleen
ayay ku yidhaahdeen, Maanta haddaad doonayso inaad
dadkan addoon u ahaatid oo aad u adeegtid, haddaba
u jawaab oo waxaad kula hadashaa erayo wanaagsan,
oo markaasay weligood addoommo kuu ahaanayaan. 8
Laakiinse wuu ka tegey taladii odayaashu kula taliyeen,
oo haddana wuxuu la arrinsaday raggii dhallinyarada ahaa
oo isaga la koray ee hortiisa joogay. 9 Oo wuxuu iyagii ku
yidhi, War maxaad igula talinaysaan oo aan jawaab ugu
celinnaa dadkan ila hadlay oo igu yidhi, War harqoodkii
aabbahaa na saaray noo fududee? 10 Markaasay raggii
dhallintayaraa oo isaga la koray la hadleen, oo waxay
ku yidhaahdeen, La hadal dadkii kula hadlay oo kugu
yidhi, Aabbahaa harqood daran buu na saaray ee adigu
noo fududee. Oo waxaad ku tidhaahdaa, Faryaradaydu
waa ka sii dhumuc weyn tahay aabbahay dhexdiisa. 11
Haddaba meeshii aabbahay harqood culus idinka saaray,
anna culays baan idiinku sii darayaa; oo aabbahay wuxuu

idinku edbin jiray shaabuugyo, laakiinse anigu waxaan
idinku edbinayaa hangarallayaal. 12 Sidaas daraaddeed
Yaaraabcaam iyo dadkii oo dhammuba maalintii saddexaad
ayay Rexabcaam u yimaadeen siduu boqorku hore ugu
amray markuu ku yidhi, Maalinta saddexaad igu soo noqda.
13 Markaasaa boqorkii ka tegey taladii ragga odayaasha
ahaa, oo dadkiina si qallafsan ayuu ugu jawaabay, 14
oo wuxuu kula hadlay taladii raggii dhallintayaraa, oo ku
yidhi, Aabbahay harqood culus buu idin saaray, laakiinse
anna culays kalaan idiinku sii darayaa; aabbahay wuxuu
idinku edbin jiray shaabuugyo, laakiinse anigu waxaan
idinku edbinayaa hangarallayaal. 15 Sidaas daraaddeed
boqorkii dadkii ma uu dhegaysan; waayo, taasu waxay ahayd
wax Rabbiga xaggiisa ka yimid, si uu u adkeeyo eraygiisii
Rabbigu kula hadlay Yaaraabcaam ina Nebaad oo uu ugu
soo dhiibay Axiiyaah kii reer Shiiloh. 16 Oo dadkii Israa'iil oo
dhammuna markay arkeen inaan boqorku dhegaysan ayaa
dadkii waxay boqorkii ugu jawaabeen oo ku yidhaahdeen,
Bal maxaan qayb ku leennahay Daa'uud? Dhaxalna kuma
lihin ina Yesay. Haddaba dadkii Israa'iilow, teendhooyinkiinnii
taga. Oo Daa'uudow, bal eeg, reerkaagii waa kuu kaas.
Markaasay dadkii Israa'iil tageen teendhooyinkoodii. 17
Laakiinse Rexabcaam wuxuu boqor u ahaa intii reer binu
Israa'iil ahayd ee degganayd magaalooyinka reer Yahuudah.
18 Markaasaa Boqor Rexabcaam wuxuu diray Adoraam
oo cashuurta u sarreeyey, oo dadkii Israa'iil oo dhammu
dhagax bay la dhaceen, wuuna dhintay. Markaasaa Boqor
Rexabcaam ku degdegay inuu fuulo gaadhifaraskiisii si uu
Yeruusaalem ugu cararo. 19 Sidaasay dadkii Israa'iil ugu
caasiyoobeen Daa'uud reerkiisii ilaa maantadan la joogo.
20 Oo markii dadkii Israa'iil maqleen in Yaaraabcaam soo
noqday ayay u cid direen oo shirkii ugu yeedheen, oo waxay
ka dhigteen boqor u taliya dadkii Israa'iil oo dhan; oo reerkii
Daa'uudna nin qudha ma raacin, qabiilkii reer Yahuudah
mooyaane. 21 Oo Rexabcaamna markuu Yeruusaalem
tegey wuxuu reer Yahuudah oo dhan iyo qabiilkii reer
Benyaamiin ka soo shiriyey boqol iyo siddeetan kun oo
rag la doortay oo dagaalyahan ahaa, si ay dadkii Israa'iil
ula diriraan oo ay boqortooyadii mar kale ugu soo celiyaan
Rexabcaam ina Sulaymaan. 22 Laakiinse Shemacyaah
oo nin Ilaah ahaa waxaa u yimid eraygii Ilaah oo leh, 23
La hadal Rexabcaam ina Sulaymaan oo reer Yahuudah
boqorka u ah, iyo reer Yahuudah iyo reer Benyaamiin, iyo
dadka intiisa kale oo dhanba, oo waxaad ku tidhaahdaa, 24
Rabbigu wuxuu leeyahay, Waa inaydnaan kor u bixin oo
aydnaan walaalihiin dadka Israa'iilna la diririn. Nin waluba
gurigiisii ha ku noqdo, waayo, waxanu aniguu iga yimid.
Sidaas aawadeed way maqleen Eraygii Rabbiga, oo intay
noqdeen ayay iska tageen sidii erayga Rabbigu ahaa. 25
Markaasaa Yaaraabcaam wuxuu dhisay Shekem oo ku
taal dalka buuraha leh oo reer Efrayim, halkaasuuna iska
degay, oo haddana halkaas wuu ka tegey oo wuxuu dhisay
Fenuu'eel. 26 Markaasaa Yaaraabcaam wuxuu qalbiga iska
yidhi, Haddaba boqortooyadu waxay u noqon doontaa reerkii
Daa'uud; 27 oo haddii dadkanu Yeruusaalem tagaan inay
Rabbiga allabaryo ugu bixiyaan, de markaas qalbigoodu
wuxuu u noqon doonaa sayidkoodii, kaasoo ah Rexabcaam
ee boqor u ah reer Yahuudah, oo markaasay i dili doonaan,
waxayna u noqon doonaan Rexabcaam ee ah boqorka
reer Yahuudah. 28 Markaasaa boqorkii tashaday, oo wuxuu
sameeyey laba weylood oo dahab ah, oo wuxuu dadkii ku
yidhi, Dadkii Israa'iilow, aad bay idiinku dhib badan tahay
inaad Yeruusaalem tagtaan, haddaba bal eega ilaahyadiinnii
idinka keenay dalkii Masar. 29 Oo labadii weylood middood
wuxuu dhigay Beytel, tii kalena wuxuu dhigay Daan. 30
Haddaba taasu waxay noqotay dembi, maxaa yeelay, dadkii
waxay u tegi jireen inay middood caabudaan xataa ilaa
Daan. 31 Oo wuxuu kaloo sameeyey guryo meelo sarsare
ah, oo wuxuu wadaaddo ka dhex doortay dadkii aan reer
Laawi ahayn oo dhan. 32 Oo haddana Yaaraabcaam wuxuu
sameeyey iid u eg tii reer Yahuudah oo ahayd bisha
siddeedaad maalinteeda shan iyo tobnaad, oo wuxuu u baxay
meeshii allabariga; sidaasuu Beytel ku sameeyey isagoo
allabari u bixinaya weylihii uu sameeyey; oo wadaaddadii
meelaha sarsare ee uu doortayna wuxuu geeyey Beytel. 33
Oo meeshii allabariga ee uu Beytel ka sameeyeyna wuxuu u
baxay bishii siddeedaad maalinteedii shan iyo tobnaad oo
taasuna waxay ahayd bishii uu qalbigiisa ka tashaday; oo iid
buu u sameeyey dadkii Israa'iil, oo meeshii allabariguu ugu
baxay inuu foox shido.

**13** Markaasaa waxaa Yahuudah ka yimid nin Ilaah oo
Eraygii Rabbiga ku yimid Beytel; oo Yaaraabcaamna
wuxuu ag taagnaa meeshii allabariga inuu foox shido
aawadeed. 2 Markaasuu wax ka gees ah meeshii allabariga
ku qayliyey sidii Rabbigu ku amray, oo wuxuu yidhi, Meeshii
allabarigay, meeshii allabarigay, Rabbigu wuxuu leeyahay,
Reer Daa'uud waxaa u dhalan doona wiil magiciisa la
yidhaahdo Yoosiyaah, oo isna dushaada wuxuu ku qali
doonaa wadaaddada meelaha sarsare ee dushaada fooxa
ku shida, oo waxaa dushaada lagu gubi doonaa dad
lafihiis. 3 Oo isla maalintaasba calaamad buu tusay oo
wuxuu yidhi, Tanu waa calaamaddii Rabbigu ku hadlay:
Bal ogaada, meesha allabarigu way kala dillaaci doontaa

oo dambaska saaranuna wuu soo daadan doonaa. **4** Oo
markii boqorkii maqlay hadalkii ninka Ilaah uu ku qayliyey ee
ka geesta ahaa meeshii allabariga oo Beytel ku tiil ayuu
Yaaraabcaam gacanta ka soo fidiyey meeshii allabariga
oo wuxuu yidhi, War ninka qabta. Oo gacantii uu isaga ku
fidiyeyna way qallashay, mar dambena wuu soo laabi kari
waayay. **5** Oo meeshii allabariguna way kala dillaacday,
oo dambaskiina wuu ka soo daatay meeshii allabariga,
sidii calaamaddii uu ninka Ilaah bixiyey ee Rabbigu ku
amray. **6** Markaasaa boqorkii ugu jawaabay ninkii Ilaah,
Haddaba Rabbiga Ilaahaaga ah raallinimo iiga bari, oo ii
ducee in gacantaydu ii soo noqoto aawadeed. Markaasaa
ninkii Ilaah Rabbiga baryay, oo boqorkiina gacantiisii way
u soo noqotay, oo waxay u noqotay sidii ay markii hore
ahayd. **7** Dabadeedna boqorkii wuxuu ninkii Ilaah ku yidhi,
Kaalay, guriga ii raac, oo isqabooji, oo anna waan kuu
abaalgudayaa. **8** Kolkaasaa ninkii Ilaah wuxuu boqorkii ku
yidhi, Xataa haddaad gurigaaga badhkiis i siinayso ku raaci
maayo, oo innaba kibisna ku cuni maayo, biyona ka cabbi
maayo meeshan; **9** waayo, Erayga Rabbiga ayaa saas igu
amray, oo yidhi, Waa inaadan kibis cunin, biyona cabbin,
waana inaadan dib u sii qaadin jidkii aad soo martay. **10**
Oo sidaas daraaddeed jid kaluu maray, dib umana uu sii
qaadin jidkii uu Beytel u soo maray. **11** Waagaas waxaa
Beytel degganaa nebi duq ah, oo wiilashiisii midkood baa
u yimid oo u soo sheegay kulli shuqulladii ninka Ilaah
maalintaas Beytel ku sameeyey; oo erayadii uu boqorka kula
hadlayna aabbahood way u soo sheegeen. **12** Markaasaa
aabbahood ku yidhi, Jidkee buu qaaday? Oo wiilashiisuna
way arkeen jidkii ninkii Ilaah oo Yahuudah ka yimid qaaday.
**13** Markaasuu wiilashiisii ku yidhi, War dameerka ii kooreeya.
Dameerkiina way u kooreeyeen oo isna wuu fuulay. **14** Oo
ninkii Ilaah wuu daba galay, oo helay isagoo geed hoos
fadhiya; kolkaasuu ku yidhi, War ma waxaad tahay ninkii
Ilaah oo Yahuudah ka yimid? Isna wuxuu yidhi, Haah, waan
ahay. **15** Markaasuu ku yidhi, Kaalay oo gurigaygii ii raac aad
kibis soo cuntide. **16** Isna wuxuu yidhi, Kari maayo inaan kula
noqdo iyo inaan gurigaaga galo toona. Halkan innaba kibis
kugula cuni maayo, biyona kugula cabbi maayo. **17** Waayo,
erayga Rabbigu wuxuu igu yidhi, Waa inaadan meeshaas
kibis ku cunin, biyona ka cabbin, jidkii aad soo martayna dib
ha u sii qaadin. **18** Isna wuxuu ku yidhi, War anba waxaan
ahay nebi kula mid ah, oo malaa'ig baa Eraygii Rabbiga
igula hadashay oo igu tidhi, Isaga soo celi oo gurigaaga
keen inuu kibis cuno oo biyo cabbo. Laakiinse been buu u
sheegay. **19** Sidaas daraaddeed wuu la noqday, oo gurigiisii
buu kibis ka cunay, biyona ka cabbay. **20** Markaasaa intay
miiska wada fadhiyeen uu eraygii Rabbigu u yimid nebigii
soo celiyey. **21** Wuuna ku qayliyey ninkii Ilaah oo Yahuudah
ka yimid, oo ku yidhi, Rabbigu wuxuu leeyahay, Caasi baad
ku noqotay Rabbiga, mana aadan xajin amarkii Rabbiga
Ilaahaaga ahu kugu amray, **22** laakiinse waad soo noqotay
oo kibis baad ku cuntay, biyona waad ku cabtay meeshii
uu kugu yidhi, Kibis ha ku cunin, biyona ha ku cabbin.
Sidaas daraaddeed meydkaagu gaadhi maayo xabaashii
awowayaashaa. **23** Oo markuu kibis cunay oo biyo cabbay
dabadeed ayuu dameerkiisii u kooreeyey nebigii uu soo
celiyey. **24** Oo markuu ka tegey ayaa libaax jidkii kaga hor
yimid, wuuna dilay isagii; oo meydkiisiina waxaa lagu tuuray
jidka dhexdiisa, oo dameerkiina wuu ag taagnaa; libaaxiina
wuxuu dhinac taagnaa meydka. **25** Oo bal eeg, dad baa
soo ag maray, oo waxay arkeen meydka jidka lagu tuuray
iyo libaaxa meydka agtiisa taagan; oo waxay yimaadeen
magaaladii nebiga duqa ahu degganaa, markaasay dadkii
u sheegeen. **26** Oo nebigii isaga jidka ka soo celiyey
markuu taas maqlay ayuu yidhi, Waa ninkii Ilaah oo ku
caasiyoobay Rabbiga; oo sidaas daraaddeed ayuu Rabbigu
isaga ugu gacan gashay libaaxa dildillaacsaday oo dilay,
taasuna waa sidii uu ahaa erayguu Rabbigu kula hadlay. **27**
Markaasuu wiilashiisii la hadlay oo ku yidhi, War dameerka ii
kooreeya. Oo iyana way u kooreeyeen. **28** Kolkaasuu tegey
oo wuxuu helay meydkiisii oo jidka dhex yaal, iyo dameerkii
iyo libaaxii oo meydka ag taagan; libaaxiina meydkii ma
cunin, dameerkiina ma dildillaacsan. **29** Oo nebigiina wuxuu
qaaday meydkii ninkii Ilaah, oo kor saaray dameerkii, wuuna
soo celiyey. Markaasuu yimid magaaladii nebigii duqa ahaa
inuu halkaas ku aaso oo ugu baroorto. **30** Oo xabaashiisii uu
isagu lahaa ayuu meydkiisii geliyey, wayna u baroorteen, oo
yidhaahdeen, Hoognay, walaalkayow! **31** Oo markuu aasay
dabadeed ayuu wiilashiisii la hadlay oo ku yidhi, Markaan
dhinto igu xabaala xabaashii ninkii Ilaah lagu xabaalay, oo
lafahayga lafihiisa ag dhiga. **32** Waayo, hadalkii uu amarkii
Rabbiga ku qayliyey ee ka geesta ahaa meesha allabariga
oo Beytel ku taal, iyo kulli guryaha meelaha sarsare oo ku
yaal magaalooyinka reer Samaariya, hubaal wuu ahaan
doonaa. **33** Oo waxyaalahaas dabadood Yaaraabcaam
kama uu noqon jidkiisii sharka ahaa, laakiinse wuxuu dadkii
oo dhan ka doortay wadaaddo meelaha sarsare; oo mid
kasta oo doonayayba wuu daahiriyey inay jiraan wadaaddo
meelaha sarsare. **34** Oo taasuna dembi bay u noqotay
reer Yaaraabcaam iyo xataa inay gooyso oo dhulka ka
baabbi'iso.

**14** Oo waagaas ayaa Abiiyaah oo ahaa ina Yaaraabcaam
bukooday. **2** Markaasaa Yaaraabcaam wuxuu bilcantiisii
ku yidhi, Waan ku baryayaaye, kac oo isbeddel, oo yaan
lagu aqoon inaad tahay bilcantii Yaaraabcaam; oo waxaad
tagtaa Shiiloh, waayo, halkaas waxaa jooga Nebi Axiiyaah
oo ii sheegay inaan dadkan boqor u ahaanayo. **3** Oo waxaad
qaaddaa toban xabbadood oo kibis ah, iyo buskuddo, iyo
ubbo malab ah, oo isaga u tag; oo wuxuu kuu sheegi
doonaa waxa wiilka ku dhici doona. **4** Oo Yaaraabcaam
bilcantiisiina sidaasay yeeshay, oo waxay u kacday Shiiloh
oo gurigii Axiiyaah bay timid. Haddaba Axiiyaah waxba
ma arki karin, waayo, indhihiisii waxay la dhaceen dugow
aawadiis. **5** Markaasaa Rabbigu wuxuu Axiiyaah ku yidhi,
Bal eeg, Yaaraabcaam bilcantiisii ayaa kuugu imanaysa inay
ku weyddiiso wax ku saabsan wiilkeeda, maxaa yeelay,
isagu wuu bukaa; haddaba iyada saas iyo saas ku dheh;
waayo, markay kuu timaado waxay iska dhigaysaa naag
kale. **6** Oo markii Axiiyaah maqlay sanqadhii cagaheeda,
markii ay albaabka soo gashay ayuu ku yidhi, Soo gal,
Yaaraabcaam bilcantiisay, maxaadse isaga dhigaysaa mid
kale? Waayo, waxaa la iigu soo kaa dhiibay war xun. **7**
Haddaba tag, oo Yaaraabcaam waxaad ku tidhaahdaa,
Rabbiga ah Ilaaha reer binu Israa'iil wuxuu leeyahay, Anigu
dadka oo dhan waan kaa sara mariyey, oo waxaan amiir
kaaga dhigay dadkaygii Israa'iil, **8** oo boqortooyadiina intaan
reerkii Daa'uud ka soo xoogay ayaan ku siiyey, oo weliba ma
aadan ahaan sidii addoonkaygii Daa'uud, kii amarradaydii
xajiyey, oo qalbigiisa oo dhanna igu raacay inuu sameeyo
wixii hortayda ku qummanaa oo keliya, **9** laakiinse waxaad
samaysay shar ka sii badan kii intii kaa horraysay oo dhan,
oo waxaad samaysatay ilaahyo kale iyo sanamyo la shubay,
waanad iga xanaajisay, oo waxaad igu tuurtay gadaashaada.
**10** Sidaas daraaddeed, bal ogow, shar baan ku soo dejin
doonaa reer Yaaraabcaam, oo Yaaraabcaam waxaan ka
baabbi'in doonaa wiil kasta, ha ahaado mid kasta oo dalka
Israa'iil ku dhex xidhan ama mid kasta oo ku dhex furan,
oo reer Yaaraabcaam oo dhanna waan xaaqi doonaa ilaa
uu wada baabbo'o sida digo dibadda loogu xaaqo. **11** Oo
Yaaraabcaam dadkiisa kii magaalada kaga dhinta waxaa
cuni doona eeyaha, oo kii duurka kaga dhintana waxaa
cuni doona haadka samada, waayo, Rabbigu saasuu ku
hadlay. **12** Haddaba kac, oo gurigaaga tag, oo mar alla
markay cagahaagu magaalada galaan ayuu wiilkii dhiman
doonaa. **13** Oo dadka dalka Israa'iil oo dhan ayaa u barooran
doona oo aasi doona, waayo, dadka Yaaraabcaam oo
dhan isaga keliya ayaa xabaasha gelaya, maxaa yeelay,
reer Yaaraabcaam isaga keliya ayaa laga helay wax ku
wanaagsan xagga Rabbiga ah Ilaaha reer binu Israa'iil. **14** Oo
weliba Rabbigu wuxuu sara kicin doonaa boqor u taliya dadkii
Israa'iil, oo kaasuna maalintaas wuxuu baabbi'in doonaa reer
Yaaraabcaam, laakiinse taasu waa goorma? Waa haddeer.
**15** Waayo, Rabbigu wuxuu dadkii Israa'iil u layn doonaa sida
cawsduur biyo ugu ruxmado, oo dadkii Israa'iil wuu ka rujin
doonaa dalkan wanaagsan oo uu siiyey awowayaashood, oo
wuxuu ku firdhin doonaa Webiga shishadiisa, maxaa yeelay,
waxay samaysteen geedihii Asheeraah, oo Rabbigana
saasay uga xanaajiyeen. **16** Oo Rabbigu wuxuu dadka dalka
Israa'iil u sii daynayaa dembiyadii Yaaraabcaam dembaabay
oo uu dadka dalka Israa'iilna dembaajiyey aawadood.
**17** Markaasay Yaaraabcaam bilcantiisii kacday oo tagtay,
oo waxay timid Tirsaah; oo markay guriga iriddiisii soo
gaadhay ayaa wiilkii dhintay. **18** Oo dadkii dalka Israa'iil oo
dhammu way aaseen, wayna u wada baroorteen siduu ahaa
eraygii Rabbigu ku hadlay ee uu nebigii ahaa addoonkiisii
Axiiyaah u soo dhiibay. **19** Oo Yaaraabcaam falimihiisii kale
ee ku saabsanaa siduu u diriray, iyo siduu u talin jiray,
waxay ku qoran yihiin kitaabka taariikhda boqorradii dalka
Israa'iil. **20** Oo Yaaraabcaamna wuxuu talinayay laba iyo
labaatan sannadood; markaasuu dhintay oo awowayaashiis
la seexday, oo waxaa meeshiisii boqor ka noqday wiilkiisii
Naadaab. **21** Oo Rexabcaam ina Sulaymaanna boqor buu
ka ahaa dalka Yahuudah. Oo markuu Rexabcaam boqor
noqday wuxuu jiray kow iyo afartan sannadood, oo toddoba
iyo toban sannadood ayuu boqor ku ahaa Yeruusaalem oo
ahayd magaaladii Rabbigu ka doortay qabiilooyinkii reer
binu Israa'iil oo dhan inuu magiciisa halkaas dhigo. Oo
hooyadiis magaceeduna wuxuu ahaa Nacamaah tii reer
Cammoon. **22** Oo reer Yahuudahna waxay sameeyeen
wax Rabbiga hortiisa shar ku ah, oo waxay Rabbiga kaga
hinaasiyeen dembiyadoodii ay galeen oo ka badnaa kuwii ay
awowayaashood galeen. **23** Waayo, waxay buur kasta oo
dheer dusheed iyo geed kasta oo dheer oo doog ah hoostiis
ka dhisteen meelo sarsare, iyo tiirar, iyo geedo Asheeraah.
**24** Oo weliba dalka waxaa joogay makhnuudyo, oo waxay u
wada sameeyeen sidii kulli karaahiyadii ay samayn jireen
quruumihii Rabbigu ka eryay reer binu Israa'iil hortooda. **25**
Oo sannaddii shanaad oo Boqor Rexabcaam ayaa Shiishaq
oo boqorkii Masar ahaa Yeruusaalem ku kacay, **26** oo
wuxuu qaatay khasnadihii guriga Rabbiga iyo khasnadihii
guriga boqorka, oo dhammaantood wuu wada qaatay;
oo wuxuu kaloo wada qaatay gaashaammadii dahabka
ahaa oo Sulaymaan sameeyey. **27** Oo Boqor Rexabcaam
ayaa meeshoodii ka sameeyey gaashaammo naxaas ah,
oo wuxuu u dhiibay saraakiishii waardiyayaashii albaabkii

guriga boqorka dhawri jiray. 28 Oo mar alla markii boqorku
gurigii Rabbiga galo ayay waardiyayaashu gaashaammada
qaadi jireen, oo haddana waxay ku soo celin jireen qolkii
waardiyayaasha. 29 Haddaba Rexabcaam falimihiisii kale iyo
wixii uu sameeyey oo dhammuba sow kuma qorna kitaabkii
taariikhda boqorradii dalka Yahuudah? 30 Oo Rexabcaam
iyo Yaaraabcaamna dagaal baa ka dhexayn jiray had iyo
goorba. 31 Oo Rexabcaamna wuu dhintay oo la seexday
awowayaashiis, oo waxaa lagula aasay awowayaashiis
magaaladii Daa'uud; oo hooyadiis magaceeduna wuxuu
ahaa Nacamaah tii reer Cammoon. Oo meeshiisiina waxaa
boqor ka noqday wiilkiisii Abiiyaam.

**15** Haddaba sannaddii siddeed iyo tobnaad ee Boqor
Yaaraabcaam ina Nebaad ayaa Abiiyaam boqor ka
noqday dalka Yahuudah. 2 Oo saddex sannadood ayuu
boqor ku ahaa Yeruusaalem, oo hooyadiis magaceedana
waxaa la odhan jiray Macakaah ina Abiishaaloom. 3 Oo
isna wuxuu sameeyey dembiyadii uu aabbihiis samayn jiray
isaga hortiis oo dhan, oo qalbigiisuna Rabbiga Ilaahiisa
ah uguma qummanayn sidii qalbigii awowgiis Daa'uud oo
kale. 4 Habase yeeshee Daa'uud daraaddiis ayaa Rabbiga
Ilaahiis ahu Yeruusaalem ka dhex siiyey laambad inuu
isaga dabadiis wiilkiisa dhiso iyo inuu Yeruusaalem adkeeyo
aawadeed, 5 maxaa yeelay, Daa'uud wuxuu sameeyey wixii
Rabbiga hortiisa ku qummanaa, oo cimrigiisii oo dhanna
kama uu leexan wax kasta oo uu ku amray, xaalkii Uuriyaah
kii reer Xeed oo keliya mooyaane. 6 Oo Rexabcaam iyo
Yaaraabcaamna dagaal baa ka dhexeeyey cimrigiisii oo
dhanba. 7 Oo Abiiyaam falimihiisii kale iyo wixii uu sameeyey
oo dhammuba sow kuma qorna kitaabkii taariikhda boqorradii
dalka Yahuudah? Oo Abiiyaam iyo Yaaraabcaamna dagaal
baa ka dhexeeyey. 8 Oo Abiiyaam wuu dhintay oo la
seexday awowayaashiis, oo waxaa lagu aasay magaaladii
Daa'uud; oo meeshiisiina waxaa boqor ka noqday wiilkiisii
Aasaa. 9 Oo boqorkii dalka Israa'iil oo Yaaraabcaam ahaa
sannaddiisii labaatanaad ayaa Aasaa boqor ka noqday dalka
Yahuudah. 10 Oo wuxuu Yeruusaalem boqor ka ahaa kow
iyo afartan sannadood; oo hooyadiisna magaceedu wuxuu
ahaa Macakaah ina Abiishaaloom. 11 Oo Aasaa wuxuu
sameeyey wixii Rabbiga hortiisa ku qummanaa sidii uu
awowgiis Daa'uud yeelay oo kale. 12 Oo makhnuudyadiina
dalka wuu ka eryay, sanamyadii aabbihiis sameeyey oo
dhanna wuu wada fogeeyey. 13 Macakaah oo hooyadiis
ahaydna boqoradnimadii wuu ka dejiyey, maxaa yeelay,
waxay sanam karaahiya ah u samaysay geed Asheeraah,
oo Aasaa sanamkeedii wuu jebiyey, wuxuuna ku gubay
durdurka Qidroon agtiisa. 14 Laakiinse meelihii sarsare
lama baabbi'in; habase yeeshee Aasaa qalbigiisu waa
ku qummanaa Rabbiga hortiisa cimrigiisii oo dhanba. 15
Oo gurigii Rabbigana wuxuu soo geliyey alaabtii aabbihiis
quduuska ka dhigay iyo alaabtii uu isaga qudhiisu quduuska
ka dhigay, waxayna ahayd lacag iyo dahab iyo weelal. 16 Oo
cimrigoodii oo dhanna dagaal baa ka dhexeeyey Aasaa iyo
Bacshaa oo ahaa boqorkii dalka Israa'iil. 17 Oo Bacshaa oo
ahaa boqorkii dalka Israa'iil ayaa dalka Yahuudah ku kacay,
oo wuxuu dhisay Raamaah, inuusan qofna u oggolaan inuu
ka baxo ama u galo Aasaa oo ahaa boqorkii dalka Yahuudah.
18 Markaasaa Aasaa qaaday kulli lacagtii iyo dahabkii ku
hadhay khasnadihii guriga Rabbiga iyo khasnadihii guriga
boqorka oo dhan, oo wuxuu u dhiibay addoommadiisa, oo
Boqor Aasaa wuxuu iyagii u diray Benhadad ina Tabrimmoon
oo ahaa ina Xesyoon, oo dalka Suuriya boqorka u ahaa oo
Dimishaq degganaa, oo wuxuu ku yidhi, 19 Aniga iyo adiga
axdi baa inoo dhexeeya, oo aabbahay iyo aabbahaana wuu
u dhexayn jiray; haddaba bal eeg, waxaan kuu soo diray
hadiyad lacag iyo dahab ah, saas aawadeed tag oo jebi
axdiga aad la leedahay boqorka dalka Israa'iil oo Bacshaa
ah, ha iga tagee. 20 Markaasaa Benhadad dhegaystay
hadalkii Boqor Aasaa, oo saraakiishii ciidammadiisa ayuu
u diray magaalooyinkii dalka Israa'iil, oo waxay dagaal ku
dhufteen Ciyoon, iyo Daan, iyo Aabeel Beytmacakaah, iyo
Kinnered oo dhan, iyo dalkii reer Naftaali oo dhan. 21 Kolkii
Bacshaa taas maqlay wuu ka tegey Raamaah dhisiddeedii,
oo wuxuu degay Tirsaah. 22 Markaasaa Boqor Aasaa wuxuu
dalka Yahuudah oo dhan gaadhsiiyey naado ogeysiis ah, oo
ninna lagama reebin; oo waxay wada qaadeen dhagxantii iyo
alwaaxdii Raamaah ee uu Bacshaa ku dhisayay, kolkaasaa
Boqor Aasaa wuxuu ku dhisay Gebac oo ku taal dalka
reer Benyaamiin iyo Misfaah. 23 Haddaba Aasaa falimihiisa
kale, iyo xooggiisii oo dhan, iyo wixii uu sameeyey oo
dhan, iyo magaalooyinkii uu dhisay oo dhammuba sow
kuma qorna kitaabka taariikhda boqorradii dalka Yahuudah?
Laakiinse markuu gaboobay wuxuu ka bukooday cagaha. 24
Markaasaa Aasaa dhintay oo la seexday awowayaashiis, oo
waxaa awowayaashiis lagula aasay magaaladii awowgiis
Daa'uud; oo meeshiisiina waxaa boqor ka noqday wiilkiisii
Yehooshaafaad 25 Oo Naadaab oo ahaa ina Yaaraabcaam
boqor buu ka noqday dalka Israa'iil sannaddii labaad oo
Aasaa boqorkii dalka Yahuudah; oo wuxuu dalka Israa'iil
boqor ka ahaa laba sannadood. 26 Oo isna wuxuu sameeyey
wixii Rabbiga hortiisa shar ku ahaa, oo wuxuu ku socday
jidkii aabbihiis, iyo dembigiisa uu dadkii Israa'iil dembaajiyey.
27 Oo waxaa shirqoolay Bacshaa ina Axiiyaah oo ahaa

reer Isaakaar, oo Bacshaa isaguu ku dilay Gibbetoon tan
ay reer Falastiin lahaayeen, waayo, Naadaab iyo dadkii
dalka Israa'iil oo dhammuba waxay weerarayeen Gibbetoon.
**28** Oo isaga Bacshaa wuxuu dilay oo meeshiisii boqor ka
noqday sannaddii saddexaad ee Aasaa oo ahaa boqorkii
dalka Yahuudah. **29** Oo haddiiba markuu boqor noqday ayuu
wada laayay reerkii Yaaraabcaam oo dhan, oo Yaaraabcaam
uma uu dayn qof keliya oo neefsada, laakiinse wuu wada
baabbi'iyey, sidii uu ahaa eraygii Rabbigu u soo dhiibay
addoonkiisii Axiiyaah kii reer Shiiloh; **30** waayo, waxay saas
u noqotay Yaaraabcaam dembiyadiisii uu dembaabay, oo uu
dadkii Israa'iilna dembaajiyey, iyo xanaaqii uu ka xanaajiyey
Rabbiga ah Ilaaha dalka Israa'iil. **31** Haddaba Naadaab
falimihiisii kale, iyo wixii uu sameeyey oo dhammuba sow
kuma qorna kitaabka taariikhda boqorrada dalka Israa'iil? **32**
Cimrigood oo dhan dagaal baa ka dhexeeyey Aasaa iyo
Bacshaa oo boqor ka ahaa dalka Israa'iil. **33** Oo boqorkii
dalka Yahuudah oo Aasaa ahaa sannaddiisii saddexaad
ayaa Bacshaa ina Axiiyaah boqor dalka Israa'iil ugu noqday
Tirsaah, oo wuxuu boqor ahaa afar iyo labaatan sannadood.
**34** Oo isna wuxuu sameeyey wax Rabbiga hortiisa shar ku
ah, oo wuxuu ku socday jidkii aabbihiis Yaaraabcaam, iyo
dembigiisii uu dadkii Israa'iilna dembaajiyey.

**16** Markaas waxaa Yeehuu ina Xanaanii u yimid Eraygii
Rabbiga oo ka gees ah Bacshaa, oo leh, **2** Ciiddaan kaa
sara mariyey, oo waxaan kaa dhigay amiir u taliya dadkayga
Israa'iil, oo adna waxaad ku socotay jidkii Yaaraabcaam,
oo dadkaygii Israa'iilna waad dembaajisay, oo waxaad ka
dhigtay inay dembiyadoodii igaga xanaajiyaan, **3** sidaas
daraaddeed bal eeg, Bacshaa iyo reerkiisa oo dhanba
waan wada baabbi'inayaa, oo reerkaagana waxaan ka
dhigayaa sidii reerkii Yaaraabcaam ina Nebaad oo kale. **4**
Oo dadka Bacshaa kii magaalada kaga dhinta waxaa cuni
doona eeyaha, oo kii duurka kaga dhintana waxaa cuni
doona haadka samada. **5** Haddaba Bacshaa falimihiisii
kale, iyo wixii uu sameeyey, iyo xooggiisii oo dhammu sow
kuma qorna kitaabkii taariikhda boqorradii dalka Israa'iil? **6**
Markaasaa Bacshaa dhintay oo la seexday awowayaashiis,
oo waxaa lagu aasay Tirsaah, oo meeshiisiina waxaa
boqor ka noqday wiilkiisii Eelaah. **7** Haddana waxaa Nebi
Yeehuu ina Xanaanii u yimid Eraygii Rabbiga oo ka gees ah
Bacshaa iyo reerkiisaba, sababtuna waxay ahayd sharkii
uu Rabbiga hortiisa ku sameeyey oo dhan ee uu Rabbiga
kaga xanaajiyey shuqulkii gacmihiisa, markuu la mid noqday
reer Yaaraabcaam, iyo diliddii uu dilay aawadeed. **8** Oo
Aasaa oo ahaa boqorkii dalka Yahuudah sannaddiisii lix
iyo labaatanaad ayaa Eelaah oo ahaa ina Bacshaa dalka
Israa'iil boqor ugu noqday Tirsaah, oo wuxuu boqor ahaa
laba sannadood. **9** Oo addoonkiisii Simrii oo sirkaal u
ahaa gaadhifardoodkiisa badhkood ayaa isaga shirqoolay.
Haddaba wuxuu joogay Tirsaah isagoo khamri ku cabbaya
guriga Arsaa oo madax u ahaa reerkiisii Tirsaah ku yiil; **10**
oo waxaa u soo galay Simrii, markaasuu wax ku dhuftay,
oo dilay isagii, waxayna ahayd Aasaa oo ahaa boqorkii
dalka Yahuudah sannaddiisii toddoba iyo labaatanaad,
oo meeshiisiina isagaa boqor ka noqday. **11** Isla markuu
boqor noqday ee uu carshigiisii ku fadhiistay wuxuu wada
laayay reerkii Bacshaa oo dhan; oo ugama uu reebin dadkii
qaraabadiisa ahaa ama saaxiibbadiis toona xataa wiil yar oo
keliya. **12** Oo Simrii saasuu u baabbi'iyey reerkii Bacshaa oo
dhan, oo waxay noqotay sidii Eraygii Rabbiga ee Bacshaa
ka geesta ahaa ee Nebi Yeehuu ku hadlay, **13** sababtuna
waxay ahayd dembiyadii Bacshaa iyo dembiyadii wiilkiisii
Eelaah oo dhan ee ay dembaabeen ee ay dadkii Israa'iilna
dembaajiyeen ee ay Rabbiga ah Ilaaha reer binu Israa'iil kaga
xanaajiyeen falimahoodii aan waxtarka lahayn. **14** Haddaba
Eelaah falimihiisii kale, iyo wixii uu sameeyey oo dhammuba
sow kuma qorna kitaabkii taariikhda boqorradii dalka Israa'iil?
**15** Oo Aasaa oo ahaa boqorkii dalka Yahuudah sannaddiisii
toddoba iyo labaatanaad ayaa Simrii intii toddoba maalmood
ah boqor ku ahaa Tirsaah. Haddaba dadkii waxay iyagoo ka
gees ah ag degeen Gibbetoon oo ay reer Falastiin lahaayeen.
**16** Oo dadkii magaalada ag degay waxay maqleen oo lagu
yidhi, Simrii shirqool buu sameeyey oo boqorkiina wuu
dilay. Sidaas daraaddeed dadkii dalka Israa'iil oo dhammu
waxay maalintaas xerada dhexdeeda dalka Israa'iil boqor
uga dhigeen Coomrii oo ahaa sirkaalkii ciidanka. **17** Oo
Coomrii wuxuu ka kacay Gibbetoon isagoo ay dadkii Israa'iil
oo dhammu la socdaan, markaasay Tirsaah hareereeyeen.
**18** Markii Simrii arkay in magaaladii la qabsaday ayuu galay
qalcaddii gurigii boqorka, kolkaasuu gurigii boqorka isku
gubay, wuuna u dhintay **19** dembiyadiisii uu dembaabay
markuu sameeyey wixii Rabbiga hortiisa shar ku ahaa, oo
uu ku socday jidkii Yaaraabcaam, iyo dembigii uu sameeyey
ee uu dadkii Israa'iilna dembaajiyey. **20** Haddaba Simrii
falimihiisii kale iyo fallaagowgiisii uu sameeyeyba sow
kuma qorna kitaabkii taariikhda boqorradii dalka Israa'iil?
**21** Markaasaa dadkii dalka Israa'iil laba meelood u kala
qaybsamay; dadkii badhkiis wuxuu raacay Tibnii oo ahaa ina
Giinad, oo boqor bay ka dhigteen; badhkii kalena wuxuu
raacay Coomrii. **22** Laakiinse dadkii Coomrii raacay waxay ka
adkaadeen dadkii raacay Tibnii ina Giinad. Markaasaa Tibnii
dhintay, Coomriina boqor buu noqday. **23** Oo Aasaa oo ahaa
boqorkii dalka Yahuudah sannaddiisii kow iyo soddonaad

ayaa Coomrii dalka Israa'iil boqor ka noqday, oo wuxuu boqor
ahaa laba iyo toban sannadood oo Tirsaah wuxuu boqor ka
ahaa lix sannadood. 24 Oo Shemer ayuu buurtii Samaariya
kaga iibsaday laba talanti oo lacag ah; markaasuu buurta
dusheedii magaalo ka dhisay, oo magaaladii uu dhisay
magaceediina wuxuu u bixiyey Samaariya, oo wuxuu ku
magacaabay ninkii Shemer ahaa ee buurta lahaa. 25 Oo
Coomriina wuxuu sameeyey wixii Rabbiga hortiisa shar ku
ahaa, oo wuxuu ku kacay shar ka sii daran sharkii kuwii
isaga ka horreeyey oo dhan. 26 Oo wuxuu ku socday jidkii
Yaaraabcaam ina Nebaad oo dhan, iyo dembiyadii uu dadkii
Israa'iil dembaajiyey ee ay Rabbiga ah Ilaaha reer binu
Israa'iil kaga xanaajiyeen falimahoodii aan waxtarka lahayn.
27 Haddaba Coomrii falimihiisii kale ee uu sameeyey, iyo
xooggiisii uu muujiyeyba sow kuma qorna kitaabkii taariikhda
boqorradii dalka Israa'iil? 28 Markaasaa Coomrii dhintay oo
la seexday awowayaashiis, oo waxaa lagu aasay Samaariya;
oo wiilkiisii Axaab ayaa meeshiisii boqor ka noqday. 29
Oo Aasaa oo ahaa boqorkii dalka Yahuudah sannaddiisii
siddeed iyo soddonaad ayaa Axaab oo ahaa ina Coomrii
dalka Israa'iil boqor ka noqday, oo wuxuu dalka Israa'iil
Samaariya boqor ugu ahaa laba iyo labaatan sannadood. 30
Oo Axaab oo ahaa ina Coomrii wuxuu sameeyey wixii shar
ku ahaa Rabbiga hortiisa oo ka sii daran sharkii kuwii isaga
ka horreeyey oo dhan. 31 Markaas sidii iyadoo la sahlan
isaga inuu sameeyo dembiyadii Yaaraabcaam ina Nebaad,
wuxuu guursaday Yesebeel oo ahayd ina Etbacal boqorkii
reer Siidoon, wuuna tegey oo u adeegay oo caabuday
Bacal. 32 Oo Bacal aawadiis wuxuu meel allabari uga dhisay
gurigii Bacal ee uu hore uga dhex dhisay Samaariya. 33
Oo haddana Axaab wuxuu sameeyey geed Asheeraah, oo
Axaab haddana wuu ka sii xanaajiyey Rabbiga ah Ilaaha reer
binu Israa'iil si ka sii daran boqorradii dalka Israa'iil ee isaga
ka horreeyey oo dhan. 34 Oo wakhtigiisii Yerixoo waxaa
dhisay nin reer Beytel ah oo magiciisa la odhan jiray Xii'eel;
oo markuu aasaaskeedii dhigay waxaa ka dhintay wiilkiisii
curadka ahaa oo Abiiraam ahaa, markuu irdaheedii taagayna
waxaa ka dhintay wiilkiisii yaraa oo Seguub ahaa, oo waxay
noqotay sidii eraygii Rabbigu kula hadlay Yashuuca ina
Nuun.

17 Oo Eliiyaah oo ahaa reer Tishbii, oo ka mid ahaa kuwii
Gilecaad degganaa ayaa Axaab ku yidhi, Waxaan
Rabbiga ah Ilaaha reer binu Israa'iil ee aan hortiisa
taaganahay noloshiisa ugu dhaartay inaan dharab iyo
roob midna sannadahan la arki doonin, sidaan leeyahay
mooyaane. 2 Markaasaa haddana waxaa isagii u yimid
Eraygii Rabbiga oo leh, 3 Halkan ka tag, oo u leexo xagga
bari, oo waxaad ku ag dhuumataa durdurka Keriid ee ku
hor yaal Webi Urdun. 4 Oo waxaad ka cabbi doontaa
durdurka, oo tukayaashana waan ku amray inay halkaas
kugu quudiyaan. 5 Sidaas daraaddeed wuu tegey, oo wuxuu
yeelay sidii erayga Rabbigu ku yidhi, waayo, wuu tegey oo ag
joogi jiray durdurka Keriid ee ku hor yaal Webi Urdun. 6 Oo
tukayaasha ayaa subaxdii u keeni jiray kibis iyo hilib, fiidkiina
kibis iyo hilib, oo biyona durdurkuu ka cabbi jiray. 7 Oo in
yar dabadeed ayaa durdurkii iska engegay, maxaa yeelay,
dalku roob ma lahayn. 8 Markaasaa waxaa isagii u yimid
Eraygii Rabbiga oo leh, 9 Kac oo waxaad tagtaa Sarefta oo
ay reer Siidoon leeyihiin, oo halkaas iska deg; oo bal eeg,
naag carmal ah oo halkaas joogta waxaan ku amray inay
ku quudiso. 10 Sidaas daraaddeed wuu kacay, oo wuxuu
tegey Sarefta, oo markuu magaaladii iriddeedii yimid waxaa
halkaas joogtay naag carmal ah oo xaabo guranaysa; oo
intuu u yeedhay ayuu ku yidhi iyadii, Waan ku baryayaaye,
wuxoogaa biyo ah weel iigu keen aan cabbee. 11 Oo markay
u sii socotay inay u keento ayuu u yeedhay oo ku yidhi,
Waan ku baryayaaye waxaad gacanta iigu soo qaaddaa
in yar oo kibis ah. 12 Iyana waxay tidhi, Waxaan Rabbiga
Ilaahaaga ah noloshiisa ugu dhaartay inaanan kibis haysan
innaba, laakiinse waxaan haystaa sacab muggiis oo jidhiidh
ah oo weel ku jira, iyo in yar oo saliid ah oo kusad ku jirta, oo
bal eeg, laba qori baan u guranayaa si aan intaan gurigayga
galo ugu diyaariyo aniga iyo wiilkayga, dabadeedna aan
cunno oo aan dhimannee. 13 Markaasaa Eliiyaah ku yidhi
iyadii, Ha cabsane tag oo yeel sidaad tidhi, laakiinse marka
hore ii soo samee in yar oo kibis ah oo ii keen, dabadeedna
u samee adiga iyo wiilkaaga. 14 Waayo, Rabbiga ah Ilaaha
reer binu Israa'iil wuxuu leeyahay, Weelka jidhiidha ahu
idlaan maayo, kusadda saliidda ahuna idin gabi mayso ilaa
maalinta Rabbigu dhulka roob ku soo daayo. 15 Markaasay
tagtay oo waxay yeeshay sidii Eliiyaah ku yidhi, oo iyadii iyo
isagii iyo reerkeediiba maalmo badan bay wax cunayeen. 16
Oo weelkii jidhiidha ahaa ma uu idlaan, kusaddii saliidda
ahaydna ma ay gabin, oo waxay ahaatay siduu ahaa eraygii
Rabbigu u soo dhiibay Eliiyaah. 17 Oo waxyaalahaas
dabadood ayaa naagtii guriga lahayd wiilkeedii bukooday, oo
xataa neef keliyahu kuma hadhin, maxaa yeelay, bukaankiisu
aad buu u xumaa. 18 Markaasay Eliiyaah ku tidhi, War nin
yahow Ilaah, maxaa inoo dhexeeya? War ma waxaad iigu
timid inaad dembigayga i soo xusuusisid oo aad wiilkayga
dishid? 19 Markaasuu ku yidhi, Naa bal wiilkaaga ii keen.
Oo intuu isagii ka qaaday xabadkeedii ayuu kor ula baxay
qowladdii uu isagu degganaa, oo wuxuu saaray sariirtiisii. 20

Markaasuu Rabbiga u qayshaday, oo ku yidhi, Rabbiyow,
Ilaahayow, naagta carmalka ah oo aan la degganahay ma
shar baad ku soo dejisay intaad wiilkeedii dishay? **21** Oo
saddex jeer ayuu wiilka korkiisii isku kala bixiyey, oo intuu
Rabbiga u qayshaday ayuu yidhi, Rabbiyow, Ilaahayow,
waan ku baryayaaye, wiilkan naftiisii mar kale ha ku soo
noqoto. **22** Markaasaa Rabbigu dhegaystay Eliiyaah codkiisii,
oo yarka naftiisii mar kalay ku soo noqotay, wuuna soo
noolaaday. **23** Dabadeedna Eliiyaah yarkii buu soo qaaday,
oo intuu qowladdii ka soo dejiyey ayuu gurigii keenay, oo u
dhiibay hooyadiis; wuxuuna Eliiyaah iyadii ku yidhi, Bal eeg,
wiilkaagii waa nool yahaye. **24** Markaasaa naagtii waxay
Eliiyaah ku tidhi, Haatan waan garanayaa inaad tahay nin
Ilaah, iyo inuu run yahay erayga Ilaah oo afkaaga ku jira.

**18** Oo wakhti dheer dabadiis waxay noqotay in sannaddii
saddexaad eraygii Rabbigu Eliiyaah u yimid oo uu ku
yidhi, Tag oo Axaab istus, oo anna roob baan dhulka ku soo
daynayaa. **2** Markaasaa Eliiyaah wuxuu u tegey inuu Axaab
istuso. Oo abaartuna aad bay ugu xumayd Samaariya. **3**
Markaasaa Axaab wuxuu u yeedhay Cobadyaah oo shuqulkii
guriga u sarreeyey. (Haddaba Cobadyaah Rabbiga aad buu
uga cabsan jiray, **4** waayo, markay Yesebeel baabbi'isay
nebiyadii Rabbiga ayaa Cobadyaah kaxeeyey boqol nebi, oo
kontonba god buu ku qariyey, oo wuxuu ku quudin jiray kibis
iyo biyo.) **5** Markaasaa Axaab wuxuu Cobadyaah ku yidhi,
Bal tag, oo dalka oo dhan dhex mar, ilaa ilaha biyaha oo
dhan, iyo durdurrada oo dhan, waaba intaasoo aynu daaq
helnaa, si aynu fardaha iyo baqlaha u noolayno, oo ayan
cuudka oo dhammu nooga dhammaan. **6** Sidaas daraaddeed
dhulkii way qaybsadeen inay soo wada dhex maraan; Axaab
keligiis dhan buu u sahamiyey, Cobadyaahna dhankii kaluu
keligiis u sahamiyey. **7** Oo bal eeg, Cobadyaah intuu jidkii sii
socday ayaa waxaa ka hor yimid Eliiyaah; oo wuu aqooday,
markaasuu wejiga dhulka saaray, oo wuxuu yidhi, Eliiyaahow
sayidkaygiiyow, ma adigii baa? **8** Markaasuu ugu jawaabay,
Haah, waa anigii; haddaba tag oo sayidkaagii waxaad ku
tidhaahdaa, War Eliiyaah halkanuu joogaa. **9** Markaasuu
wuxuu ku yidhi isagii, War maxaan ku dembaabay, oo
aad u doonaysaa anoo addoonkaaga ah inaad Axaab ii
gacangeliso inuu i dilo aawadeed? **10** Rabbiga Ilaahaaga
ah noloshiisaan ku dhaartaye inaan la arag quruun iyo
boqortooyo uusan sayidkaygu cid u dirin si uu kaaga goobo;
oo markay yidhaahdeen, Halkan ma joogo, ayuu boqortooyo
kasta iyo quruun kastaba dhaariyey inay ku waayeen. **11** Oo
imminka waxaad leedahay, Tag, oo sayidkaagii u sheeg in
Eliiyaah halkan joogo. **12** Oo bal eeg waxay noqon doontaa
markaan kaa tago in Ruuxa Rabbigu kuu qaadi doona meel
aanan aqoon, oo sidaas daraaddeed markaan Axaab u
tago oo kuu soo sheego, oo uu ku waayo aniguu i dilayaa;
laakiinse anigoo addoonkaaga ah Rabbiga waan ka cabsan
jiray tan iyo dhallinyaranimadaydii. **13** Oo sayidkaygiiyow,
miyaan laguu sheegin wixii aan sameeyey markii Yesebeel
laysay nebiyadii Rabbiga, iyo sidaan u qariyey boqol nin oo
Rabbiga nebiyadiisii ah, oo aan kontonba god geliyey, oo
aan kibis iyo biyo ku quudiyey? **14** Oo hadda waxaad igu
leedahay, Tag oo sayidkaagii u sheeg in Eliiyaah halkan
joogo; oo isna wuu i dilayaa. **15** Markaasaa Eliiyaah wuxuu
ku yidhi isagii, Waxaan ku dhaartay Rabbiga ciidammada
ee aan hor taagnahay noloshiisa inaan xaqiiqa maanta
isaga isu muujinayo. **16** Sidaas daraaddeed Cobadyaah
wuxuu u tegey inuu Axaab la kulmo, wuuna u soo sheegay;
markaasaa Axaab u tegey inuu Eliiyaah la kulmo. **17** Oo
markuu Axaab arkay Eliiyaah ayuu ku yidhi, War ma adigii
baa kii dadkii Israa'iil dhibayayow? **18** Markaasuu u jawaabay,
oo ku yidhi, Anigu dadkii Israa'iil ma aanan dhibin, laakiinse
waxaa dhibay adiga iyo reerka aabbahaa, waayo, waxaad
ka tagteen amarradii Rabbiga, oo weliba waxaad raacday
Bacaliim. **19** Haddaba sidaas daraaddeed u cid dir, oo
dadkii Israa'iil oo dhan, iyo Bacal nebiyadiisa ah afarta boqol
iyo konton, iyo geedihii Asheeraah nebiyadooda ah afar
boqol oo miiska Yesebeel wax ka cuna, kulli ku soo wada
ururi Buur Karmel. **20** Sidaas daraaddeed Axaab wuxuu u
cid diray dadkii Israa'iil oo dhan, oo nebiyadiina wuxuu ku
soo wada ururiyey Buur Karmel. **21** Markaasaa Eliiyaah u
soo dhowaaday dadkii oo dhan, oo wuxuu ku yidhi, War
ilaa goormaad laba ra'yi u dhexaynaysaan? War haddii
Rabbigu Ilaah yahay isaga raaca, laakiinse haddii Bacal
Ilaah yahay isaga raaca. Oo dadkiina isagii xataa eray keliya
uguma jawaabin. **22** Markaasaa Eliiyaah wuxuu haddana
dadkii ku yidhi, Anigoo keliya ayaa ka hadhay nebiyadii
Rabbiga, laakiinse Bacal nebiyadiisu waa afar boqol iyo
konton nin. **23** Haddaba bal laba dibi ha naloo keeno, oo
iyagu dibi ha doorteen, oo ha jarjareen, oo qoryaha ha dul
saareen, oo innaba dab yay hoosta ka gelin; oo anna dibiga
kalaan qalayaa, oo qoryahaan dul saarayaa, oo innaba dab
hoosta ka gelin maayo. **24** Oo markaas idinku u yeedha
magaca ilaahiinna, oo anna waxaan u yeedhanayaa magaca
Rabbiga; oo markaas Ilaahii dab ku soo jawaabaa ha ahaado
Ilaah. Markaasaa dadkii oo dhammu jawaabeen oo waxay
yidhaahdeen, Kaasu waa hadal wanaagsan. **25** Markaasaa
Eliiyaah wuxuu nebiyadii Bacal ku yidhi, Bal idinku dibi doorta
oo marka hore qala, dabse hoosta ha ka gelinina, oo idinku
waad badan tihiine marka hore u yeedha magaca ilaahiinna.
**26** Markaasay qaateen dibigii la siiyey, wayna qaleen, oo

aroortii ilaa duhurkii ayay u yeedhanayeen magicii Bacal, oo
waxay lahaayeen, Bacalow, na maqal! Laakiinse cod iyo wax
iyaga u jawaabay toona ma jirin. Oo meeshii allabariga oo la
dhisay hareeraheeda ayay boodboodayeen. 27 Oo waxay
duhurkii noqotay inuu Eliiyaah iyagii ku majaajilooday oo ku
yidhi, War aad u qayliya; waayo, waa ilaah, oo mindhaa
wuu isla tashanayaa, ama gees buu u leexday, ama socdaal
buu ku maqan yahay, ama mindhaa wuu iska hurdaa oo
waa in la toosiyaa. 28 Markaasay aad u qayliyeen, oo sidii
caadadoodu ahayd waxay isku jareen mindiyo iyo eebooyin
ilamaa dhiig ka soo burqaday. 29 Oo markii hadhkii la
dhaafay ayay sidii nebi wax sii sheegayeen ilaa wakhtigii
la bixin jiray allabarigii fiidnimada, laakiinse cod iyo wax u
jawaaba iyo wax ka dan leh midna ma jirin. 30 Markaasaa
Eliiyaah wuxuu dadkii oo dhan ku yidhi, Haddaba ii soo
dhowaada; kolkaasaa dadkii oo dhammu u soo dhowaadeen,
dabadeedna meeshii allabariga ee Rabbiga ee la dumiyey
ayuu hagaajiyey. 31 Oo wuxuu Eliiyaah soo qaaday laba
iyo toban dhagax oo ka dhigan intii qabiilooyinkii wiilashii
Yacquub tiradoodu ahayd, kaasoo eraygii Rabbigu u yimid
oo ku yidhi, Magacaagu wuxuu ahaan doonaa Israa'iil. 32 Oo
dhagxantii wuxuu meel allabari ugu dhisay magaca Rabbiga,
oo meeshii allabariga hareeraheeda wuxuu ka qoday meel
ku wareegsan oo qaadi karta laba qiyaas oo midho ah.
33 Oo qoryihiina si hagaagsan buu u saaray, oo dibigiina
intuu jarjaray ayuu qoryihii dul saaray. Markaasuu yidhi, Afar
barmiil biyo ka soo buuxiya oo ku dul shuba qurbaanka la
gubo iyo qoryahaba. 34 Oo haddana wuxuu ku yidhi, Sidii
oo kale mar labaad yeela, iyana way yeeleen mar labaad.
Oo haddana wuxuu ku yidhi, Sidii oo kale mar saddexaad
yeela, oo iyana way yeeleen mar saddexaad. 35 Oo biyihii
waxay qulquleen meeshii allabariga hareeraheeda, oo xataa
meeshii la qodayna wuxuu ka buuxshay biyo. 36 Oo markii
la gaadhay wakhtigii la bixin jiray allabarigii fiidnimada, Nebi
Eliiyaah waa soo dhowaaday, oo wuxuu yidhi, Rabbiyow,
Ibraahim iyo Isxaaq iyo Israa'iil Ilaahoodiiyow, maanta dalka
Israa'iil ha lagu dhex ogaado inaad adigu Ilaah tahay, oo
aan anna ahay addoonkaaga, iyo inaan waxyaalahan oo
dhan eraygaaga ku sameeyey. 37 Rabbiyow, i maqal oo
i maqal, inay dadkanu ogaadaan inaad adigu Ilaah tahay
Rabbiyow, iyo inaad qalbigooda soo celisay. 38 Markaasaa
Rabbiga dabkiisii soo dhacay oo wuxuu gubay allabariga
la gubo, iyo qoryihii, iyo dhagxantii, iyo boodhkii, oo xataa
biyihii godka ku jirayna ololkii baa leefay. 39 Oo markii
dadkii taas arkay ayay wejiga u wada dhaceen; oo waxay
yidhaahdeen, Rabbigu isagu waa Ilaah, Rabbigu isagu
waa Ilaah. 40 Markaasaa Eliiyaah wuxuu ku yidhi iyagii,
Nebiyada Bacal qabta oo midna yuusan ka baxsan. Oo iyana
way soo qabteen; markaasaa Eliiyaah wuxuu iyagii keenay
durdurka Qiishoon agtiisa, oo halkaasuu iyagii ku laayay. 41
Markaasaa Eliiyaah wuxuu Axaab ku yidhi, War kac oo wax
cun, oo wax cab, waayo, waxaa sanqadhaya roob badan! 42
Markaasaa Axaab u kacay inuu wax cuno oo wax cabbo. Oo
Eliiyaahna wuxuu fuulay Buur Karmel dusheeda, oo intuu
foororsaday ayuu dhulka ku sujuuday oo wejigiisiina wuxuu
geliyey lowyihiisa dhexdooda. 43 Markaasuu midiidinkiisii ku
yidhi, Bal tag oo badda xaggeeda fiiri. Kolkaasuu tegey oo
wax fiiriyey, oo wuxuu yidhi, Waxba lama arko. Oo haddana
wuxuu ku yidhi, Ku noqo toddoba jeer. 44 Oo waxaa dhacday
inuu markii toddobaad yidhi, Waxaa badda ka kacday daruur
yar oo nin gacantiis le'eg. Isna wuxuu yidhi, Orod oo waxaad
Axaab ku tidhaahdaa, War, gaadhifaraskaaga diyaarso oo
dhaadhac, yaan roobku ku joojine. 45 Oo wakhti yar dabadiis
cirkii ayaa daruuro iyo dabayl la madoobaaday, oo waxaa
jiray roob weyn. Oo Axaabna gaadhifaraskiisii buu fuulay,
oo wuxuu tegey Yesreceel. 46 Oo Eliiyaah waxaa la jiray
gacantii Rabbiga, oo intuu guntigiisii dhexda ku giigsaday
ayuu Axaab hor ordayay ilaa meeshii Yesreceel laga galo.

**19** Oo markaasaa Axaab wuxuu Yesebeel u sheegay kulli
wixii Eliiyaah sameeyey oo dhan, iyo siduu nebiyadii
oo dhan seef ugu laayay. 2 Markaasaa Yesebeel farriin
u dirtay Eliiyaah oo ku tidhi, Sidaas iyo si ka sii daranba
ilaahyadu ha igu sameeyeen haddaanan berrito hadda oo
kale naftaada ka dhigin sidii mid iyaga ka mid ah naftiisii. 3
Oo isna markuu saas ogaaday ayuu kacay oo naftiisii la
carararay, oo wuxuu yimid Bi'ir Shebac oo dalka Yahuudah
ka mid ahaa, markaasuu midiidinkiisii halkaas kaga tegey.
4 Laakiinse isagii intii maalin socodkeed ah ayuu cidlada
sii dhex maray, oo intuu meel yimid ayuu hoos fadhiistay
geed rotem la yidhaahdo; oo wuxuu weyddiistay inuu dhinto,
oo yidhi, Rabbiyow, haatan waabase naftayda iga qaad,
waayo, anigu kama aan fiicni awowayaashay. 5 Markaasuu
jiifsaday, oo hoos seexday geed rotem ah, kolkaasaa waxaa
taabtay malaa'ig, oo waxay ku tidhi, Toos oo wax cun. 6
Kolkaasuu wax fiiriyey oo wuxuu arkay kibis dhuxul lagu
dubay iyo kusad biyo ah oo madaxiisa yaal. Markaasuu wax
cunay oo wax cabbay oo haddana wuu iska jiifsaday. 7
Markaasaa malaa'igtii Rabbiga mar labaad u timid, oo intay
taabatay ayay ku tidhi, Toos oo wax cun, maxaa yeelay,
sodcaalku waa kugu dheer yahay. 8 Markaasuu toosay, oo
wax cunay, oo wax cabbay, oo cuntadaas itaalkeedii ayuu
ku socday afartan maalmood iyo afartan habeen ilaa uu
gaadhay Xoreeb oo ahayd buurtii Ilaah. 9 Oo intuu halkaas

yimid ayuu god iska galay, oo halkaasuu baryay, oo bal eeg,
waxaa isagii u yimid Eraygii Rabbiga, oo wuxuu ku yidhi,
Eliiyaah, maxaad halkan ka samaynaysaa? 10 Isna wuxuu
yidhi, Anigu Rabbiga ah Ilaaha ciidammada aawadiis ayaan
aad ugu hinaasay; waayo, dadkii Israa'iil axdigaagii way
ka tageen, oo meelahaagii allabarigana way dumiyeen, oo
nebiyadaadiina seef bay ku laayeen; oo aniga keligay ayaa
ka hadhay, oo waxay doonayaan inay naftayda iga qaadaan.
11 Oo isna wuxuu ku yidhi, Ka bax, oo buurta fuul oo Rabbiga
hortiisa istaag. Oo bal eeg, waxaa meeshaas soo maray
Rabbiga, oo hortiisa ayaa dabayl weyn oo xoog badan
buurihii kala jejebisay, dhagxantiina burburisay; laakiinse
Rabbigu kuma jirin dabaysha; oo dabayshii dabadeedna
waxaa jiray dhulgariir, oo Rabbiguna kuma jirin dhulgariirka.
12 Oo dhulgariirkii dabadiisna waxaa jiray dab, laakiinse
Rabbigu kuma jirin dabka, oo dabkii dabadiisna waxaa jiray
cod yar oo gaaban. 13 Oo markuu Eliiyaah taas maqlay,
ayuu go'iisii wejiga ku duudduubtay oo dibadda u baxay,
oo wuxuu istaagay meeshii godka laga soo geliyey. Oo
bal eeg, markaasaa waxaa isagii u yimid cod leh, Eliiyaah,
maxaad halkan ka samaynaysaa? 14 Isna wuxuu yidhi,
Anigu Rabbiga ah Ilaaha ciidammada aawadiis ayaan aad
ugu hinaasay, waayo, dadkii Israa'iil axdigaagii way ka
tageen, oo meelahaagii allabarigana way dumiyeen, oo
nebiyadaadiina seef bay ku laayeen; oo aniga keligay ayaa
ka hadhay, oo waxay doonayaan inay naftayda iga qaadaan.
15 Markaasaa Rabbigu wuxuu ku yidhi, Tag, oo ku noqo
jidkaagii cidlada Dimishaq; oo markaad Dimishaq gaadhid
waa inaad Xasaa'eel u boqortaa dalka Suuriya. 16 Oo
Yeehuu ina Nimshiina waxaad u boqortaa dalka Israa'iil; oo
Eliishaa ina Shaafaad oo ah reer Aabeel Mehoolaahna waa
inaad u subagtaa inuu meeshaadii nebi ka ahaado. 17 Oo
markaasay waxay noqon doontaa in ninkii ka baxsada seefta
Xasaa'eel uu Yeehuu dili doono; oo kii Yeehuu seeftiisa ka
baxsadana waxaa dili doona Eliishaa. 18 Laakiinse weliba
waxaan daynayaa toddoba kun oo qof oo dalka Israa'iil ku
jirta oo aan kulligood Bacal u jilbo joogsan oo aan midkoodna
afkiisu Bacal dhunkan. 19 Sidaas daraaddeed halkaas wuu
ka tegey, oo wuxuu helay Eliishaa ina Shaafaad oo beer
ku qodaya laba iyo toban qindi oo dibi ah ee ka horreeya
isaga, oo isna wuxuu la jiray kii laba iyo tobnaad; markaasaa
Eliiyaah isagii u soo gudbay oo go'iisii ayuu ku dul tuuray.
20 Oo isna dibidii wuu ka tegey, markaasuu ka daba orday
Eliiyaah oo ku yidhi, Waan ku baryayaaye aan soo dhunkado
aabbahay iyo hooyaday, oo dabadeedna waan ku raacayaa.
Isna wuxuu ku yidhi, Haddana noqo, waayo, maxaan kugu
sameeyey? 21 Markaasuu ka noqday isagii, oo wuxuu
kaxeeyey qindigii dibida ahaa, wuuna qalay oo hilibkoodiina
ku karshay alaabtii dibida, oo wuxuu siiyey dadkii, oo iyana
way cuneen. Markaasuu kacay oo wuxuu raacay Eliiyaah,
wuuna u adeegay isagii.

20 Oo Benhadad oo ahaa boqorkii Suuriya wuxuu soo
urursaday ciidankiisii oo dhan, waxaana isaga la jiray
laba iyo soddon boqor, iyo fardo iyo gaadhifardood; oo intuu
soo kacay ayuu Samaariya hareereeyey, wuuna la diriray.
2 Markaasuu magaaladii farriin u diray oo wuxuu boqorkii
dalka Israa'iil oo Axaab ahaa ku yidhi, Anigoo Benhadad
ah, waxaan kugu leeyahay, 3 Lacagtaada iyo dahabkaaga
anigaa iska leh, oo naagahaaga, iyo carruurtaada, xataa
kuwa ugu fiican anigaa iska leh. 4 Markaasaa boqorkii dalka
Israa'iil ugu jawaabay, Boqorow, sayidkaygiiyow, waa sidaad
u tidhi, oo aniga iyo waxayga oo dhanba adigaa iska leh. 5
Oo wargeeyayaashii haddana way soo noqdeen oo waxay
yidhaahdeen, Benhadad wuxuu kugu leeyahay, Xaqiiqa
waan kuu soo cid diray oo waxaan kugu idhi, Waa inaad ii
soo dhiibto lacagtaada, iyo dahabkaaga, iyo naagahaaga,
iyo carruurtaadaba, 6 laakiinse berrito hadda oo kale waxaan
kuu soo diri doonaa addoommadayda, oo waxay soo baadhi
doonaan gurigaaga iyo guryaha addoommadaadaba, oo wax
alla wixii kula wanaagsan gacantooday ku dhigi doonaan,
wayna kaa soo qaadi doonaan. 7 Markaasaa boqorkii dalka
Israa'iil u soo yeedhay odayaashii dalka oo dhan, oo wuxuu
ku yidhi, Waan idin baryayaaye, bal eega oo ogaada sida
ninkanu iiga belaayo doonayo, waayo, wuxuu u soo cid
dirsaday naagahayga iyo carruurtayda, iyo lacagtayda, iyo
dahabkayga, oo anna uma aanan diidin. 8 Markaasaa
odayaashii oo dhan iyo dadkii oo dhammu waxay isagii
ku yidhaahdeen, Ha dhegaysan, hana oggolaan. 9 Sidaas
daraaddeed wuxuu ku yidhi kuwii Benhadad warka ka
keenay, Boqorka sayidkayga ah u sheega oo waxaad ku
tidhaahdaan, Dhammaan wixii aad markii hore ii soo dirsatay
anoo addoonkaaga ah, waan yeelayaa, laakiinse waxan
yeeli kari maayo. Oo wargeeyayaashiina way ka tageen,
oo haddana war kalay u keeneen isagii. 10 Benhadad baa
u soo cid diray oo ku yidhi, Sidaas iyo si ka sii daranba
ilaahyadu ha igu sameeyeen haddii ciidda Samaariya sacab
sacab u gaadho dadka ila socda oo dhan. 11 Markaasaa
boqorkii dalka Israa'iil wuxuu ugu jawaabay, U sheega
oo waxaad ku tidhaahdaan, Ka hubka dagaalka xidhaa
yuusan u faanin sidii midka iska fura. 12 Markii Benhadad
farriintii maqlay, isagoo khamri teendhooyinka kula cabbaya
boqorradii ayuu addoommadiisii ku yidhi, War weerar isu
diyaariya. Oo iyana markaasay magaaladii weerar isugu

diyaariyeen. 13 Oo bal eeg, nebi baa u soo dhowaaday
boqorkii dalka Israa'iil oo Axaab ahaa, oo wuxuu ku yidhi,
War Rabbigu wuxuu leeyahay, Dadkan faraha badan oo dhan
ma aragtay? Bal ogow, kulligood adigaan maanta kuu soo
gacangelinayaa, oo markaasaad ogaan doontaa inaan anigu
ahay Rabbiga. 14 Markaasaa Axaab wuxuu yidhi, Oo yuu
iigu soo gacangelinayaa? Isna wuxuu yidhi, Rabbigu wuxuu
leeyahay, Amiirradii gobollada addoommadooda ayaan
kuugu soo gacangelinayaa. Oo haddana wuxuu yidhi, Oo
dagaalka yaa bilaabaya? Wuxuu yidhi, Adiga. 15 Markaasuu
tiriyey amiirradii gobollada addoommadooda, oo waxay
ahaayeen laba boqol iyo laba iyo soddon; oo dabadoodna
wuxuu tiriyey dadkii oo dhan, oo dadkii dalka Israa'iil oo
dhammu waxay noqdeen toddoba kun. 16 Oo duhurkii
ayay baxeen. Laakiinse Benhadad khamri buu cabbayay
oo teendhooyinkii ku sakhraamayay, isaga iyo boqorradii la
jirayba, kuwaasoo ahaa laba iyo soddonkii boqor oo isaga
caawinayay. 17 Oo waxaa markii hore soo baxay amiirradii
gobollada addoommadoodii; oo Benhadadna cid buu diray,
oo waxaa loo soo sheegay oo lagu yidhi, Rag baa Samaariya
ka soo baxay. 18 Isna wuxuu yidhi, Hadday nabad u soo
baxeen iyo hadday dagaal u soo baxeenba iyagoo nool
qabqabta. 19 Sidaas daraaddeed kuwanu magaaladii way
ka soo baxeen, waxayna ahaayeen amiirradii gobollada
addoommadoodii iyo ciidankii iyaga daba socday. 20 Oo
kulligood mid waluba ninkiisii ayuu dilay; markaasaa ciidanka
Suuriya cararay, oo ciidankii Israa'iilna way eryadeen; oo
Benhadad oo ahaa boqorkii Suuriya faras buu fuulay oo
rag fardooley ah la baxsaday. 21 Markaasaa boqorkii dalka
Israa'iil baxay oo baabbi'iyey fardihii iyo gaadhifardoodkii,
oo ciidankii Suuriyana aad buu u laayay. 22 Markaasaa
nebigii u soo dhowaaday boqorkii dalka Israa'iil oo wuxuu ku
yidhi, Tag oo soo xoogayso, oo bal ogow, oo eeg waxaad
samaynaysid, waayo, markii sannaddu soo wareegto ayaa
boqorka Suuriya kugu soo duuli doonaa. 23 Oo boqorkii
Suuriya addoommadiisii waxay isagii ku yidhaahdeen, War
ilaahoodu waa ilaahii buuraha oo sidaas daraaddeed ayay
inooga xoog bateen. Haddaba aynu bannaanka kula dirirno
oo markaas hubaal waynu ka xoog badnaanaynaa. 24
Oo waxaad yeeshaa, boqorrada nin walba meeshiisii ka
saar, oo meeshoodii waxaad gelisaa taliyayaal. 25 Oo
waxaad tirsataa ciidan le'eg ciidankii kaa le'day, oo faras
kasta meeshiisii faras geli, gaadhifaras kastana meeshiisii
gaadhifaras geli; oo markaasaynu iyaga bannaanka kula
diriraynaa, oo hubaal waynu ka adkaanaynaa, oo isna
codkoodii buu maqlay oo saasuu yeelay. 26 Oo markii
sannaddii soo wareegtay ayaa Benhadad tiriyey ciidankii
Suuriya, oo intuu Afeeq tegey ayuu la diriray ciidankii Israa'iil.
27 Oo ciidankii Israa'iilna waa la tiriyey, oo saadkoodiina
waa la siiyey, markaasay iyagii ka hor tageen; oo ciidankii
Israa'iilna hortooday degeen iyagoo la moodo sidii laba
xaymood oo yaryar oo waxarro ah, laakiinse ciidankii Suuriya
dalkoo dhan bay buuxiyeen. 28 Markaasaa boqorkii dalka
Israa'iil waxaa u yimid oo la hadlay nin Ilaah, oo wuxuu ku
yidhi, Rabbigu wuxuu kugu leeyahay, Reer Suuriya waxay
yidhaahdeen, Rabbigu waa Ilaahii buuraha, laakiinse ma
aha Ilaahii dooxooyinka, oo sidaas daraaddeed dadkan
faraha badan oo dhan adigaan kuu soo gacangelinayaa, oo
markaasaad ogaan doontaan inaan anigu ahay Rabbiga. 29
Oo intii toddoba maalmood ah ayay is-hor degganaayeen. Oo
waxay noqotay in maalintii toddobaad dagaalkii bilaabmay,
oo maalin keliya ayaa ciidankii Israa'iil waxay dadkii Suuriya
ka laayeen boqol kun oo nin oo lug ah. 30 Laakiinse intoodii
kale Afeeq ayay u carareen oo magaaladay galeen, oo
toddoba iyo labaatan kun oo nin oo ka hadhayna waxaa
ku soo dhacay derbigii. Markaasaa Benhadad cararay oo
magaaladuu galay isagoo ugu gudbaya qol ilaa qol. 31 Oo
addoommadiisii waxay ku yidhaahdeen, Bal eeg, waxaannu
maqalnay in boqorrada dalka Israa'iil yihiin boqorro naxariis
badan, haddaba waannu ku baryaynaaye aannu joonyado
guntanno, oo madaxana aannu xadhko ku duudduubanno,
oo aannu boqorka dalka Israa'iil u baxno, waxaa laga yaabaa
inuu naftaada badbaadiyee. 32 Sidaas daraaddeed waxay
guntadeen joonyado, madaxyadana waxay ku duudduubteen
xadhko, oo waxay u yimaadeen boqorkii dalka Israa'iil,
oo ku yidhaahdeen, Addoonkaagii Benhadad wuxuu kugu
leeyahay, Waan ku baryayaaye maanta i bixi. Oo isna wuxuu
ku yidhi, War miyuu weli nool yahay? Isagu waa walaalkay.
33 Oo nimankiina aad bay ugu dadaaleen inay calaamad
wanaagsan ka maqlaan, oo waxay ku dhaqsadeen inay
qabsadaan in taasu maankiisa ku jirto iyo in kale, kolkaasay
waxay ku yidhaahdeen, Benhadad waa walaalkaa. Isna
wuxuu yidhi, Taga oo ii keena. Markaasaa Benhadad isagii u
soo baxay, oo isna gaadhifaraskiisii ayuu soo fuushiyey. 34
Markaasaa Benhadad wuxuu ku yidhi, Waan kuu celinayaa
magaalooyinkii aabbahay aabbahaa ka dhacay, oo waxaad
Dimishaq ka samaysataa jidad sidii aabbahay Samaariya uga
samaystay oo kale. Axaabna wuxuu ku yidhi, Axdiganaan
kugu sii daynayaa. Sidaasuu axdi ula dhigtay, wuuna iska
sii daayay. 35 Oo nin qoonkii nebiyada ka mid ah ayaa
saaxiibkiis ku yidhi, War i dil, waan ku baryayaaye, taasuna
waxay ahayd eray xagga Rabbiga ka yimid, laakiinse ninkii
waa diiday inuu dilo. 36 Kolkaasuu ku yidhi, Adigu ma
aadan addeecin Eraygii Rabbiga oo sidaas daraaddeed

bal ogow haddiiba markii aad iga tagto waxaa ku dili doona libaax. Oo haddiiba markuu isagii ka tegey ayaa waxaa helay libaax, wuuna dilay isagii. 37 Oo haddana wuxuu helay nin kale, markaasuu ku yidhi, War waan ku baryayaaye i dil. Markaasaa ninkii intuu wax ku dhuftay dhaawacay. 38 Markaasaa nebigii tegey oo boqorkii ku sugay jidka agtiisa, wuuna isku beddelay calalkiisii madaxa oo uu indhaha ku qariyey. 39 Oo markii boqorkii soo ag maray ayuu boqorkii u qayliyey, oo wuxuu ku yidhi, Anigoo addoonkaaga ahu waxaan dhex galay dagaalkii, oo bal eeg nin baa igu soo leexday, nin buuna ii keenay, oo wuxuu igu yidhi, Ninkan dhawr; oo si kastaba ha noqotee haddii hadhow la waayo, naftaadaa loo qisaasayaa, ama haddii kaleto waxaad bixin doontaa talanti lacag ah. 40 Oo anigoo addoonkaaga ah intii aan mashquul ku ahaa halkan iyo halkaas ayaa ninkii iska tegey. Markaasaa boqorkii dalka Israa'iil ku yidhi, Xukunkaagu saasuu ahaanayaa, waayo, adaa goostay. 41 Markaasuu dhaqsaday oo calalkiina indhihii ka qaaday, boqorkiina wuu gartay inuu isagu qoonkii nebiyada ka mid ahaa. 42 Markaasuu isagii ku yidhi, Rabbigu wuxuu ku leeyahay, Ninkii aan baabba'a ku xukumay ayaad gacantaada ka sii daysay, oo sidaas daraaddeed naftaadu waxay u dhiman doontaa naftiisa, dadkaaguna dadkiisa. 43 Markaasaa boqorkii dalka Israa'iil wuxuu u kacay gurigiisii isagoo calool xun, oo xanaaqsan, oo Samaariya buu yimid.

21 Oo waxyaalahaas dabadood waxay noqotay in Naabood oo ahaa reer Yesreceel uu lahaa beer canab ah oo Yesreceel ku tiil ee uu dhowayd gurigii Axaab oo ahaa boqorkii Samaariya. 2 Oo Axaab baa Naabood la hadlay, oo ku yidhi, Beertaada canabka ah i sii aan beer khudrad ah ka dhigtee, maxaa yeelay, waxay u dhow dahay gurigayga, oo adigana waxaan ku siinayaa beer canab ah oo iyada ka sii wanaagsan, amase haddii ay kula wanaagsan tahay, waxaan ku siinayaa qiimeheeda oo lacag ah. 3 Markaasaa Naabood wuxuu Axaab ku yidhi, Ilaah ha iga hayo inaan dhaxalkii awowayaashay ku siiyo. 4 Markaasaa Axaab wuxuu yimid gurigiisii isagoo calool xun oo ka xanaaqsan eraygii Naabood kii reer Yesreceel isaga kula hadlay; maxaa yeelay, wuxuu isaga ku yidhi, Ku siin maayo dhaxalkii awowayaashay. Markaasuu sariirtiisii jiifsaday, wuuna sii jeestay, oo diiday inuu wax cuno. 5 Laakiinse naagtiisii Yesebeel ayaa u timid oo waxay ku tidhi, War maxaa naftaadu u qulubsan tahay oo aad kibis la cuni weyday? 6 Markaasuu iyadii ku yidhi, Naa waxaan la hadlay Naabood kii reer Yesreceel, oo aan ku idhi, Beertaada canabka ah lacag iga siiso, ama haddii kale oo ay kula wanaagsan tahay waxaan kaa siisanayaa beer kale oo canab ah, oo isna wuxuu iigu jawaabay, Beertayda ku siin maayo. 7 Markaasaa naagtiisii Yesebeel waxay ku tidhi, War miyaadan haatan u talin boqortooyada Israa'iil? Haddaba kac oo wax cun, oo qalbigaagana ka farxi; anigaa ku siinaya Naabood ka reer Yesreceel beertiisa canabka ah. 8 Sidaas daraaddeed warqado ayay ku qortay Axaab magiciisii oo waxay ku shaabadaysay shaabaddiisii. Oo waxay warqadihii u dirtay odayaashii iyo kuwii gobta ahaa ee magaaladiisii Naabood la degganaa. 9 Oo waxay warqadaha ku qortay oo ku tidhi, War waxaad naadisaan oo tidhaahdaan, Ha la soomo; oo Naaboodna dadka ka sarraysiiya. 10 Oo hortiisana waxaad fadhiisisaan laba nin oo waxmatarayaal ah, oo iyana isaga ha ku marag fureen, oo ha ku yidhaahdeen, Adigu waxaad cayday Ilaah iyo boqorka. Markaas isaga dibadda u bixiya oo dhagaxyo la dhaca si uu u dhinto. 11 Oo dadkii magaaladiisii la degganaa ee ahaa odayaashii iyo kuwii gobta ahaa waxay yeeleen sidii Yesebeel u soo fartay oo ahayd sidii ku qornayd warqadihii ay iyaga u dirtay. 12 Waxay naadiyeen oo yidhaahdeen, Ha la soomo, oo Naaboodna ayay dadka ka sarraysiiyeen. 13 Oo waxaa yimid oo hortiisa fadhiistay laba nin oo waxmatarayaal ah, markaasaa waxmatarayaashii Naabood ku marag fureen dadka hortiisii, oo waxay yidhaahdeen, Naabood wuxuu caayay Ilaah iyo boqorkaba. Markaasay isagii magaaladii ka saareen, oo waxay la dhaceen dhagaxyo, wuuna dhintay. 14 Markaasay Yesebeel farriin u direen oo waxay ku yidhaahdeen, Naabood waa la dhagxiyey, wuuna dhintay. 15 Markii Yesebeel ay maqashay in Naabood la dhagxiyey oo uu dhintay, ayay Yesebeel Axaab ku tidhi, War kac oo iska qaado beertii canabka ahayd oo Naabood kii reer Yesreceel ee uu hore inuu lacag kaa siisto kuugu diiday; waayo, haatan Naabood ma noola, wuuse dhintay. 16 Oo markii Axaab maqlay in Naabood dhintay ayaa Axaab wuxuu u kacay inuu u dhaadhaco oo iska qaato beertii Naabood kii reer Yesreceel.
17 Oo Eraygii Rabbiga ayaa u yimid Eliiyaah kii reer Tishbii, isagoo leh, 18 War sara joogso, oo u dhaadhac boqorka dalka Israa'iil oo Axaab ah oo Samaariya deggan; oo bal eeg, wuxuu ku dhex jiraa beertii canabka ahayd oo Naabood, halkaasoo uu ugu dhaadhacay inuu iska qaato. 19 Waa inaad isaga la hadashaa, oo waxaad ku tidhaahdaa, Rabbigu wuxuu kugu leeyahay, War ma wax baad dishay, oo haddana ma wax baad qaadatay? Oo haddana isaga waxaad ku tidhaahdaa, Rabbigu wuxuu kugu leeyahay, Meeshii eeyuhu ka leefleefeen dhiiggii Naabood ayaa adiga dhiiggaagana eeyo ka leefleefi doonaan. 20 Markaasaa Axaab wuxuu ku yidhi Eliiyaah, Cadowgaygiiyow, haddana ma i heshay? Oo isna wuxuu ugu jawaabay, Haah, waan ku helay, maxaa

yeelay, waxaad isu iibisay inaad Rabbiga hortiisa wax shar ah
ku samayso. 21 Oo bal ogow, Axaabow, belaayo baan kugu
soo dejin doonaa, oo farcankaaga waan kaa qaadi doonaa,
oo waxaan kaa baabbi'in doonaa wiil kasta, ha ahaado mid
kasta oo dalka Israa'iil ku dhex xidhan ama mid kasta oo ku
dhex furan. 22 Oo reerkaagana waxaan ka dhigi doonaa sidii
reerkii Yaaraabcaam ina Nebaad iyo sidii reerkii Bacshaa
ina Axiiyaah, sababtuna waxa weeye xanaaqii aad iga
xanaajisay oo aad dadkii Israa'iilna dembaajisay aawadiis.
23 Oo Yesebeelna Rabbigu wuu ka hadlay oo yidhi, Yesebeel
eeyuhu waa ku cuni doonaan derbiga Yesreceel agtiisa. 24
Oo Axaab dadkiisa kii magaalada kaga dhinta waxaa cuni
doona eeyaha; oo kii duurka kaga dhintana waxaa cuni
doona haadka samada. 25 (Laakiinse lama arag qof Axaab
la mid ah oo isu iibiyey inuu sameeyo wax Rabbiga hortiisa
shar ku ah, kaasoo ay kicisay naagtiisii Yesebeel. 26 Oo wax
aad karaahiyo u ah ayuu sameeyey markuu sanamyo raacay
oo uu u wada sameeyey siday sameeyeen reer Amor kii
Rabbigu ka tuuray dadka Israa'iil hortooda.) 27 Kolkii Axaab
erayadaas maqlay ayuu dharkiisii jeexjeexay, oo joonyado
guntaday, wuuna soomay, oo joonyado ku dhex seexday, oo
aayar u socday. 28 Oo haddana eraygii Rabbigu wuxuu u
yimid Eliiyaah kii reer Tishbii oo ku yidhi, 29 War sow uma
jeeddid siduu Axaab hortayda isugu hoosaysiiyey? Sharka
ku soo dejin maayo intuu isagu nool yahay, maxaa yeelay,
isagu hortayduu isku hoosaysiiyey; laakiinse sharka waxaan
reerkiisa ku soo dejin doonaa wakhtiga wiilkiisa.

**22** Oo intii saddex sannadood ah ayaanu dagaal dhex
marin dadka Suuriya iyo dadka Israa'iil. 2 Oo waxay
noqotay sannaddii saddexaad in Yehooshaafaad oo dalka
Yahuudah boqor ka ahaa u yimid boqorkii dalka Israa'iil. 3
Markaasaa boqorkii dalka Israa'iil addoommadiisii ku yidhi,
War miyeydnaan ogayn inaan iska leennahay Raamod
Gilecaad? Oo annana waannu iska fadhinnaa, oo kalama
aannu bixin gacantii boqorka Suuriya! 4 Oo wuxuu
Yehooshaafaad ku yidhi, Dagaal baan Raamod Gilecaad u
tegayaaye ma i raacaysaa? Oo Yehooshaafaadna wuxuu
boqorkii dalka Israa'iil ku yidhi, Anigu kula mid baan ahay,
oo dadkayguna waa dadkaagoo kale, fardahayguna waa
fardahaagoo kale. 5 Markaasaa Yehooshaafaad boqorkii
dalka Israa'iil ku yidhi, Waan ku baryayaaye bal maanta
erayga Rabbiga wax weyddii. 6 Markaasaa boqorkii dalka
Israa'iil soo wada ururiyey nebiyadii oo ahaa in ku dhow afar
boqol oo nin, oo wuxuu ku yidhi, Raamod Gilecaad dagaal
ma u tagaa mise waan iska daayaa? Oo iyana waxay ku
yidhaahdeen, Tag, waayo, Sayidku wuxuu iyada soo gelin
doonaa gacantaada, boqorow. 7 Laakiinse Yehooshaafaad
wuxuu ku yidhi, Kuwan mooyaane miyaanu nebi Rabbigu jirin
aan wax weyddiinnee? 8 Markaasaa boqorkii dalka Israa'iil
wuxuu Yehooshaafaad ku yidhi, Weli waxaa jira nin kale oo
aan Rabbiga wax ka weyddiin karno, kaasuna waa Miikayhuu
ina Yimlaah, laakiinse waan nebcahay, maxaa yeelay, isagu
wax wanaagsan igama sheego wax xun mooyaane, oo
Yehooshaafaadna wuxuu ku yidhi, Boqorow, saas ha odhan.
9 Markaasaa boqorkii dalka Israa'iil u yeedhay mid sirkaal ah,
oo wuxuu ku yidhi, Haddiiba ii keen Miikayhuu ina Yimlaah.
10 Haddaba boqorkii dalka Israa'iil iyo Yehooshaafaad oo
ahaa boqorkii dalka Yahuudah mid kastaaba wuxuu ku
fadhiyey carshigiisii, isagoo dharkii boqornimada qaba, oo
waxay fadhiyeen meel bannaan oo ku taal iridda Samaariya
laga soo galo, oo nebiyadii oo dhammuna hortooday wax
ku sii sheegayeen. 11 Oo Sidqiyaah ina Kenacanaah ayaa
samaystay geeso bir ah, oo wuxuu yidhi, Waxaa Rabbigu
leeyahay, Kuwan waad ku hardiyi doontaa reer Suuriya ilaa
ay wada baabba'aan. 12 Oo nebiyadii oo dhammuna saasay
sii wada sheegeen, iyagoo leh, Raamod Gilecaad tag oo
guulayso, maxaa yeelay, Rabbigu wuu soo gelin doonaa
gacantaada, boqorow. 13 Oo wargeeyskii Miikayhuu loo
diray inuu u soo yeedho wuu la hadlay oo ku yidhi, Bal
eeg, nebiyadii war wanaagsan bay u sheegeen boqorkii,
oo isku af bay ku wada hadleen. Haddaba waxaan kaa
baryayaa in eraygaagu la mid noqdo eraygooda, oo adigu
wax wanaagsan ku hadal. 14 Markaasaa Miikayhuu yidhi,
Rabbiga noloshiisaan ku dhaartaye waxaan sheegayaa wax
alla wixii Rabbigu igu yidhaahdo. 15 Oo markuu boqorkii
u yimid ayaa boqorkii ku yidhi, Miikayhuuyow, Raamod
Gilecaad dagaal ma u tagnaa mase waannu iska daynaa?
Oo isna wuxuu ugu jawaabay, Tag, oo ku soo guulayso; oo
Rabbiguna iyaduu soo gelin doonaa gacantaada, boqorow.
16 Markaasaa boqorkii isagii ku yidhi, Runta mooyaane wax
kale inaadan magaca Rabbiga iigu sheegayn intee jeer
baan ku dhaariyaa? 17 Oo isna wuxuu yidhi, Waxaan arkay
dadka Israa'iil oo dhan oo buuraha ku kala firdhay sidii
ido aan adhijir lahayn, oo Rabbigu wuxuu yidhi, Kuwanu
sayid ma leh ee nin waluba gurigiisii ha ku nabad noqdo.
18 Markaasaa boqorkii dalka Israa'iil Yehooshaafaad ku
yidhi, Miyaanan kuu sheegin inuusan wax wanaagsan
iga sii sheegayn wax shar ah mooyaane? 19 Markaasuu
Miikayhuu yidhi, Haddaba erayga Rabbiga maqal, Waxaan
arkay Rabbiga oo carshigiisa ku fadhiya oo ciidankii samada
oo dhammuna taagan yihiin midigtiisa iyo bidixdiisa. 20
Markaasaa Rabbigu yidhi, Kumaa Axaab soo sasabaya
inuu Raamod Gilecaad tago oo halkaas ku dhinto? Oo mid

sidanuu yidhi, mid kalena sidaasuu yidhi. 21 Markaasaa ruux
soo baxay, oo Rabbiga hortiisa istaagay oo yidhi, Anigaa
soo sasabaya. 22 Kolkaasaa Rabbigu ku yidhi, Sidee baad u
soo sasabaysaa? Isna wuxuu yidhi, Anigu waan tegayaa oo
waxaan noqonayaa ruux beenlow ah oo afka nebiyadiisa oo
dhan ku jira. Oo Rabbigu wuxuu yidhi, Adigu waad sasabi
doontaa oo weliba waad ka adkaan doontaa, haddaba tag oo
saas yeel. 23 Haddaba bal eeg, Rabbigu afka nebiyadaadan
oo dhan wuxuu geliyey ruux beenlow ah, oo Rabbigu wuxuu
kaa sheegay wax belaayo ah. 24 Markaasaa Sidqiyaah ina
Kenacanaah intuu Miikayhuu u soo dhowaaday dhabanka ku
dhuftay, oo wuxuu ku yidhi, War ruuxii Rabbigu xaggee buu
iga maray inuu kula hadlo? 25 Kolkaasaa Miikayhuu ku yidhi,
Waad arki doontaa maalinta aad qol hoose u geli doonto
inaad ku dhuumato. 26 Markaasaa boqorkii dalka Israa'iil
yidhi, Miikayhuu qabta oo u celiya Aamoon oo ah taliyaha
magaalada, iyo Yoo'aash oo ah ina boqor; 27 oo waxaad
ku tidhaahdaan, Boqorkii wuxuu leeyahay, Ninkan xabsiga
geliya, oo waxaad ku quudisaan kibis dhib ah, oo waxaad
ka waraabisaan biyo dhib ah, ilaa aan soo nabad noqdo.
28 Markaasaa Miikayhuu ku yidhi, Sinaba haddaad ku soo
nabad noqotid, Rabbigu igama dhex hadlin. Oo wuxuu kaloo
yidhi, Dadkoo dhammow, maqla. 29 Markaasay boqorkii
dalka Israa'iil iyo Yehooshaafaad oo ahaa boqorkii dalka
Yahuudah Raamod Gilecaad u kaceen. 30 Oo boqorkii dalka
Israa'iil wuxuu Yehooshaafaad ku yidhi, Anigu waan ismidab
qarinayaa, oo dagaalkaan dhex gelayaa; laakiinse adigu
dharkaaga xidho. Oo boqorkii dalka Israa'iil wuu ismidab
qariyey oo dagaalkuu dhex galay. 31 Haddaba boqorkii
dalka Suuriya wuxuu amray laba iyo soddonkii sirkaal oo u
taliyey gaadhifardoodkiisa, oo ku yidhi, Mid weyn iyo mid
yar toona ha la diririna boqorka dalka Israa'iil oo keliya
mooyaane. 32 Oo markii saraakiishii gaadhifardoodku ay
Yehooshaafaad arkeen ayay isyidhaahdeen, Hubaal kanu
waa boqorkii dalka Israa'iil, markaasay ku leexdeen inay la
diriraan aawadeed; kolkaasaa Yehooshaafaad qayliyey. 33
Oo markii saraakiishii gaadhifardoodku ay arkeen inuusan
ahayn boqorkii dalka Israa'iil ayay dib uga noqdeen. 34 Oo
nin baa intuu qaansadiisii xooday kama' ahaan fallaadh u
ganay, oo wuxuu boqorkii dalka Israa'iil kaga dhuftay meesha
dharkiisa dagaalku isaga yimaadeen. Markaasuu boqorku kii
gaadhifaraskiisa kaxaynayay ku yidhi, Gacantaada leexi, oo
ciidanka iga dhex bixi, waayo, aad baan u dhaawacmay.
35 Oo maalintaas dagaalkii waa sii kordhay, oo boqorkiina
gaadhifaraskiisii ayaa la dhex taagay, isagoo ka hor jeeda
dadkii Suuriya, oo wuxuu dhintay makhribkii, oo dhiiggii
dhaawaca ka baxay wuxuu iska dareerayay gaadhifaraska
salkiisa. 36 Oo markii qorraxdu sii dhacaysay ayaa qaylo
ka dhex baxday ciidankii oo dhan, oo waxay lahaayeen,
War nin waluba ha tago magaaladiisii iyo waddankiisiiba.
37 Oo sidaasuu boqorkii u dhintay, oo waxaa la keenay
Samaariya, oo waxaana boqorkii lagu aasay Samaariya. 38
Oo gaadhifaraskii waxaa lagu maydhay balligii Samaariya
agtiisa, oo dhiiggiisiina eeyahaa leefleefay, oo waxay noqotay
siduu ahaa eraygii Rabbigu ku hadlay. (Haddaba dhillooyinkii
halkaasay isku maydheen.) 39 Haddaba Axaab falimihiisii
kale iyo wixii uu sameeyey oo dhan, iyo gurigii uu dhisay
oo foolka maroodiga ahaa, iyo magaalooyinkii uu dhisay
oo dhammuba sow kuma wada qorna kitaabkii taariikhda
boqorradii dalka Israa'iil? 40 Markaasuu Axaab dhintay
oo la seexday awowayaashiis, oo wiilkiisii Axasyaah ayaa
meeshiisii boqor ka noqday. 41 Oo Yehooshaafaad ina
Aasaa wuxuu boqor ka noqday dalka Yahuudah boqorkii
dalka Israa'iil oo Axaab ahaa sannaddiisii afraad. 42 Oo
Yehooshaafaad markuu boqor noqday wuxuu jiray shan iyo
soddon sannadood. Oo Yeruusaalemna shan iyo labaatan
sannadood boqor buu ku ahaa, oo hooyadiis magaceedana
waxaa la odhan jiray Casuubaah ina Shilxii. 43 Oo wuxuu ku
socday jidkii aabbihiis Aasaa ku socday oo dhan, oo geesna
ugama uu leexan, oo wixii Rabbiga hortiisa ku qummanaa
ayuu sameeyey. Habase yeeshee meelihii sarsare lama
baabbi'in, oo dadkuna weli way ku allabaryi jireen, fooxna
way ku shidi jireen meelihii sare. 44 Oo Yehooshaafaadna
nabad buu la dhigtay boqorkii dalka Israa'iil. 45 Haddaba
Yehooshaafaad falimihiisii kale, iyo xooggiisii uu muujiyey, iyo
sidii uu u dagaallamayba sow kuma qorna kitaabkii taariikhda
boqorradii dalka Yahuudah? 46 Oo makhnuudyadii intii
wakhtigii aabbihiis Aasaa ka hadhayna dalka wuu ka wada
eryay. 47 Oo Edomna boqor ma lahayn, laakiinse waxaa u
talin jiray boqor-ku-xigeen. 48 Oo Yehooshaafaadna wuxuu
samaystay doonniyo Tarshiish inay Oofir tagaan oo dahab u
doonaan aawadeed, laakiinse halkaas ma ay tegin, maxaa
yeelay, doonniyihii waxay ku burbureen Cesyoon Geber
agteeda. 49 Markaasaa Axasyaah oo ahaa ina Axaab ayaa
Yehooshaafaad ku yidhi, Addoommadaydu addoommadaada
doonniyaha ha la raaceen, laakiinse Yehooshaafaad wuu
diiday taas. 50 Oo Yehooshaafaadna wuu dhintay oo la
seexday awowayaashiis, oo waxaa awowayaashiis lagula
aasay magaaladii awowgiis Daa'uud; oo meeshiisiina waxaa
boqor ka noqday wiilkiisii Yehooraam. 51 Oo Axasyaah oo
ahaa ina Axaab wuxuu dalka Israa'iil Samaariya boqor ugu
noqday sannaddii toddoba iyo tobnaad oo Yehooshaafaad
boqorkii dalka Yahuudah, oo laba sannadood buu dalka
Israa'iil boqor ka ahaa. 52 Oo isna wuxuu sameeyey

waxa Rabbiga hortiisa shar ku ah, oo wuxuu ku socday jidkii aabbihiis maray, iyo jidkii hooyadiis martay, iyo jidkii Yaaraabcaam ina Nebaad maray, ee uu dadkii Israa'iil dembaajiyey. **53** Oo isna wuxuu u adeegay Bacal, wuuna caabuday isagii, oo weliba Rabbiga ah Ilaaha reer binu Israa'iilna wuu ka xanaajiyey, sidii aabbihiis sameeyey oo kale.

# Boqorradii Labaad

1 Oo markii Axaab dhintay dabadeed ayaa reer Moo'aab ku
caasiyoobeen dalka Israa'iil. 2 Oo Axasyaahna wuxuu ka
dhacay daaqaddii qolkiisii sare oo Samaariya ku yiil, wuuna
bukooday, markaasuu wargeeyayaal diray, oo wuxuu ku
yidhi, Taga oo Bacal Sebuub oo ah ilaaha reer Ceqroon
waxaad ii soo weyddiisaan bal inaan buktadan ka bogsanayo
iyo in kale. 3 Laakiinse malaa'igtii Rabbigu waxay ku tidhi
Eliiyaah kii reer Tishbii, Kac oo ka hor tag wargeeyayaasha
boqorka Samaariya, oo waxaad ku tidhaahdaa, War ma
Ilaah baan joogin dalka Israa'iil, oo saas aawadeed baad
Bacal Sebuub wax u soo weyddiinaysaan? 4 Haddaba
sidaas daraaddeed Rabbigu wuxuu leeyahay, Sariirta aad
fuushay ka soo degan maysid, laakiinse hubaal waad
dhimanaysaa. Dabadeedna Eliiyaah waa iska tegey. 5
Kolkaasaa wargeeyayaashii isagii ku soo noqdeen, oo isna
wuxuu ku yidhi, War maxaad u soo noqoteen? 6 Oo iyana
waxay isagii ku yidhaahdeen, War nin baa naga hor yimid, oo
wuxuu nagu yidhi, Taga, oo boqorkii idin soo diray ku noqda,
oo waxaad ku tidhaahdaan, Rabbigu wuxuu leeyahay, War
ma Ilaah baan joogin dalka Israa'iil, oo saas aawadeed baad
u cid diranaysaa in wax la soo weyddiiyo Bacal Sebuub oo
ah ilaaha reer Ceqroon? Haddaba sariirta aad fuushay ka
soo degan maysid, laakiinse hubaal waad dhimanaysaa.
7 Oo isna wuxuu iyagii ku yidhi, Ninkii idinka hor yimid
oo waxakan idiin sheegay nin caynkee ah buu ahaa? 8
Oo iyana waxay isagii ugu jawaabeen, Wuxuu ahaa nin
xaad badan, oo suun meged ahna dhexduu ku xidhnaa.
Markaasuu yidhi, Kaasu waa Eliiyaah kii reer Tishbii. 9
Markaasaa boqorkii wuxuu u diray sirkaal konton xukuma
oo wata kontonkiisii ninba. Isna kor buu ugu baxay, oo bal
eeg, buur korkeed buu fadhiyey, oo intuu la hadlay buu
ku yidhi, War nin yahow Ilaah, boqorkii wuxuu kugu soo
yidhi, Soo deg oo kaalay. 10 Oo Eliiyaahna wuxuu ugu
jawaabay sirkaalkii kontonka nin xukumay, Haddaan nin
Ilaah ahay, samada dab ha ka soo dego, oo ha baabbi'iyo
adiga iyo kontonkaaga ninba. Kolkaasaa waxaa samada
ka soo degay dab, oo wuxuu wada baabbi'iyey isagii iyo
kontonkiisii ninba. 11 Oo haddana wuxuu isagii u diray
sirkaal kale oo konton nin xukuma ee isna wata kontonkiisii.
Oo isna intuu u jawaabay buu ku yidhi, War nin yahow
Ilaah, waxaa boqorkii kugu soo yidhi, Soo deg oo haddiiba
kaalay. 12 Markaasaa Eliiyaah ugu jawaabay, Haddaan nin
Ilaah ahay, samada dab ha ka soo dego, oo ha baabbi'iyo
adiga iyo kontonkaaga ninba. Kolkaasaa waxaa samada
ka soo degay dabkii Ilaah, oo wuxuu wada baabbi'iyey
isagii iyo kontonkiisii ninba. 13 Oo haddana boqorkii wuxuu
isagii u diray sirkaal saddexaad oo konton nin xukuma ee
kontonkiisii nin wata. Oo sirkaalkii saddexaad oo kontonka
nin xukumayna kor buu ugu baxay, oo intuu u yimid ayuu
Eliiyaah hortiisa jilbo u dhacay oo baryay, oo wuxuu ku yidhi,
War nin yahow Ilaah, waan ku baryayaaye naftayda iyo
kontonkan nin oo addoommadaada ah naftooda hortaada
qaali ha ku noqdeen. 14 Waayo, bal eeg, dab baa samada
ka soo degay oo wada baabbi'iyey labadii sirkaal oo iga soo
horreeyey iyo kontomadoodiiba, laakiinse haatan naftaydu
hortaada qaali ha ku noqoto. 15 Markaasaa malaa'igtii
Rabbigu waxay Eliiyaah ku tidhi, Tag oo isaga raac; hana ka
cabsan. Kolkaasuu kacay oo intuu isagii la dhaadhacay ayuu
boqorkii u tegey. 16 Oo wuxuu isagii ku yidhi, Rabbigu wuxuu
ku leeyahay, Waxaad wargeeyayaal u soo dirtay inaad Bacal
Sebuub oo ah ilaaha reer Ceqroon wax soo weyddiiso ee
sababtu ma waxay tahay inaan dalka Israa'iil jirin Ilaah aad
hadalkiisa wax weyddiiso? Haddaba sidaas daraaddeed
sariirtii aad fuushay ka soo degan maysid, laakiinse hubaal
waad dhimanaysaa. 17 Markaasuu u dhintay sidii Eraygii
Rabbiga oo Eliiyaah ku hadlay ahaa. Oo Yehooraam ayaa
boqor ka noqday meeshiisii, oo taasuna waxay dhacday
Yehooraam ina Yehooshaafaad oo boqor ka ahaa dalka
Yahuudah sannaddiisii labaad, maxaa yeelay, isagu wiil ma
uu lahayn. 18 Haddaba Axasyaah falimihiisii kale ee uu
sameeyey sow kuma qorna kitaabkii taariikhda boqorradii
dalka Israa'iil?

2 Oo markii Rabbigu doonayay inuu Eliiyaah samada
dabayl cirwareen ah ugu qaado ayaa Eliiyaah wuxuu
Gilgaal ka raacay Eliishaa. 2 Markaasaa Eliiyaah wuxuu
Eliishaa ku yidhi, Waan ku baryayaaye halkan iska joog,
waayo, Rabbigu wuxuu ii diray tan iyo Beytel. Oo Eliishaana
wuxuu yidhi, Waxaan ku dhaartay Rabbiga noloshiisa iyo
adiga naftaadee inaanan kaa tagayn. Sidaas daraaddeed
waxay ku wada dhaadhaceen Beytel. 3 Oo qoonkii nebiyada
ahaa oo Beytel joogay ayaa Eliishaa u soo baxay, oo waxay
ku yidhaahdeen, War ma og tahay in Rabbigu maanta
sayidkaaga kaa qaadi doono? Oo isna wuxuu ku yidhi, Haah,
waan ogahaye iska aamusa. 4 Markaasaa Eliiyaah wuxuu
ku yidhi isagii, Eliishaa, waan ku baryayaaye halkan iska
joog, waayo, Rabbigu haddana wuxuu ii diray Yerixoo. Oo
isna wuxuu yidhi, Waxaan ku dhaartay Rabbiga noloshiisa
iyo adiga naftaadee inaanan kaa tagayn. Sidaas daraaddeed
waxay yimaadeen Yerixoo. 5 Oo haddana qoonkii nebiyada
ahaa oo Yerixoo joogay ayaa Eliishaa u soo dhowaaday,
oo waxay ku yidhaahdeen, War ma og tahay in Rabbigu

maanta sayidkaaga kaa qaadi doono? Oo isna wuxuu ugu
jawaabay, Haah, waan ogahaye iska aamusa. **6** Markaasaa
Eliiyaah wuxuu ku yidhi isagii, Waan ku baryayaaye halkan
iska joog, waayo, Rabbigu wuxuu ii diray Webi Urdun.
Oo isna wuxuu ku yidhi, Waxaan ku dhaartay nolosha
Rabbiga iyo adiga naftaadee inaanan kaa tagayn. Markaasay
labadiiba israaceen. **7** Oo waxaa tegey konton nin oo qoonkii
nebiyada ahaa ah, oo waxay istaageen meel hortooda ah
oo cabbaar ka fog; oo labadoodiina waxay istaageen Webi
Urdun agtiisa. **8** Markaasaa Eliiyaah go'iisii qaaday oo
duudduubay, oo biyihii ku dhuftay, iyana xagga iyo xagga
ayay u kala qaybsameen, sidaas daraaddeed labadoodiiba
waxay mareen dhul engegan. **9** Oo haddana markii ay
ka gudbeen, Eliiyaah wuxuu Eliishaa ku yidhi, War intaan
layga kaa qaadin ka hor i weyddiiso wax aan kuu sameeyo.
Markaasaa Eliishaa yidhi, Waan ku baryayaaye ruuxaaga
labanlaabkiis ha igu soo dego. **10** Isna wuxuu yidhi, Wax
aad u adag baad i weyddiisatay; habase yeeshee haddaad i
aragtid markii layga kaa qaado, sidaasay kuu ahaanaysaa,
haddii kalese saas ahaan mayso. **11** Oo intii ay sii socdeen,
oo ay sheekaysanayeen ayaa waxaa u muuqday gaadhifaras
dab ah iyo fardo dab ah, oo labadoodii bay kala dhex
mareen, markaasaa Eliiyaah wuxuu kor u raacay dabayl
cirwareen ah oo wuxuu galay samada. **12** Oo Eliishaana
taas wuu arkay, oo wuxuu ku qayliyey, Aabbow, Aabbow,
gaadhifardoodkii dadkii Israa'iil iyo raggoodii fardooleyda
ahaa! Oo isna mar dambe uma uu jeedin; oo dharkiisii buu
intuu ku dhegay laba inood u kala jeexay. **13** Markaasuu
qaaday Eliiyaah go'iisii ka dhacay, oo dib buu u noqday oo
soo istaagay Webi Urdun qarkiisa. **14** Oo wuxuu qaaday
Eliiyaah go'iisii ka dhacay, oo intuu biyihii ku dhuftay ayuu
yidhi, Meeh Rabbiga ah Ilaaha Eliiyaah? Oo markuu biyihii
ku dhuftay ayay xagga iyo xagga u kala qaybsameen;
markaasaa Eliishaa ka gudbay. **15** Oo qoonkii nebiyada ahaa
oo Yerixoo joogay ee isaga ka soo hor jeeday markay arkeen
waxay yidhaahdeen, Eliiyaah ruuxiisii wuxuu ku dul hadhay
Eliishaa. Oo intay isagii ka hor yimaadeen ayay hortiisa
ku sujuudeen. **16** Oo iyana waxay isagii ku yidhaahdeen,
War waannu ku baryaynaaye annagoo addoommadaada ah
waxaa nala jira konton nin oo xoog leh, haddaba iyagu ha
tageen oo sayidkaagii ha dooneen, waayo, waaba intaasoo
Ruuxa Rabbigu isagii qaaday, oo uu ku xooray buur dusheed
ama dooxo. Oo isna wuxuu yidhi, Waa inaydaan cid dirin.
**17** Oo way ku sii adkeeyeen ilaa uu xishooday, kolkaasuu
yidhi, Dira. Sidaas daraaddeed waxay direen konton nin; oo
waxay isagii doondoonayeen saddex maalmood, laakiinse
sooma ay helin. **18** Markaasay u soo noqdeen isagoo
weli Yerixoo iska jooga; oo wuxuu ku yidhi, Sow idinkuma
odhan, Ha tegina? **19** Markaasaa dadkii magaaladu waxay
Eliishaa ku yidhaahdeen, Waannu ku baryaynaaye bal eeg,
meeshay magaaladanu taal way wanaagsan tahay sidaad
aragto, sayidkayagow, laakiinse biyuhu way xun yihiin, oo
dhulkuna si wanaagsan wax uma bixiyo. **20** Isna wuxuu
yidhi, Waxaad ii keentaan weel cusub oo cusbo ku soo
shuba. Oo iyana way u keeneen. **21** Oo isna wuxuu tegey
ishii biyaha, oo intuu cusbadii ku tuuray ayuu yidhi, Rabbigu
wuxuu leeyahay, Biyahan waan bogsiiyey. Oo hadda ka dib
ma yeelan doonaan dhimasho iyo waxbixinla'aan toona. **22**
Sidaas daraaddeed biyihii way bogsadeen ilaa maantadan
la joogo, oo way noqotay sidii eraygii Eliishaa ku hadlay.
**23** Markaasuu halkaas uga kacay Beytel, oo intuu jidka sii
socday ayaa carruur yaryaru magaaladii ka soo baxday
oo ku majaajiloodeen, oo waxay ku yidhaahdeen, Bidaar
weyne bax, bidaar weyne bax. **24** Oo isna markaasuu
gadaashiisa dhugtay oo arkay iyagii, oo magicii Rabbiga
ayuu ku habaaray. Markaasaa dhirtii waxaa ka soo baxay
laba orso oo dhaddig oo waxay dildillaacsadeen laba iyo
afartan carruurtii ka mid ahaa. **25** Oo isna halkaasuu uga
kacay Buur Karmel, markaasuu meeshaas uga noqday
Samaariya.

**3** Haddaba Yehooraam ina Axaab ayaa dadka Israa'iil
Samaariya boqor ugu noqday, taasuna waxay ahayd
sannaddii siddeed iyo tobnaad ee Yehooshaafaad boqorkii
dalka Yahuudah, oo wuxuuna boqor ahaa laba iyo toban
sannadood. **2** Oo wuxuu sameeyey wax Rabbiga hortiisa
shar ku ah, laakiinse uma samayn sidii aabbihiis iyo sidii
hooyadiis u sameeyeen oo kale, waayo, wuu riday tiirkii
Bacal oo aabbihiis sameeyey. **3** Habase yeeshee wuxuu ku
dhegay dembigii Yaaraabcaam ina Nebaad, ee uu dadkii
Israa'iil dembaajiyey, kaas kama uu tegin. **4** Haddaba
boqorkii reer Moo'aab oo Meeshaac ahaa ido buu lahaa,
oo wuxuu boqorkii dalka Israa'iil baad u siin jiray boqol
kun oo baraar ah, iyo boqol kun oo wan dhogortood. **5**
Laakiinse markii Axaab dhintay ayaa boqorkii Moo'aab
ku caasiyoobay boqorkii dalka Israa'iil. **6** Oo markaasaa
Boqor Yehooraam ka baxay Samaariya, oo wuxuu soo safay
dadkii Israa'iil oo dhan. **7** Oo intuu tegey ayuu u cid dirtay
Yehooshaafaad oo ahaa boqorkii dalka Yahuudah, oo wuxuu
ku yidhi, Waxaa igu caasiyoobay boqorkii Moo'aab, haddaba
ma i raacaysaa aan Moo'aab la dirirnee? Isna wuxuu yidhi,
Haah, waan ku raacayaa, waayo, waxaan ahay adigoo kale,
dadkayguna waa sida dadkaaga oo kale, fardahayguna waa
sida fardahaaga oo kale. **8** Oo isna wuxuu yidhi, War jidkee
baynu maraynaa? Markaasuu ugu jawaabay, Jidka cidlada

Edom. 9 Sidaas daraaddeed waxaa israacay boqorkii dalka
Israa'iil, iyo boqorkii dalka Yahuudah, iyo boqorkii dalka
Edom; oo waxay wareegeen meel toddoba maalmood loo
socdo; oo ciidankii iyo xayawaankii la socday toona biyo
ma helin. 10 Markaasaa boqorkii dalka Israa'iil wuxuu yidhi,
Hoogay! waayo, Rabbigu wuxuu saddexdayadan boqor
isugu yeedhay inuu gacanta reer Moo'aab na geliyo. 11
Laakiinse Yehooshaafaadba wuxuu yidhi, War sow ma joogo
nin ah Rabbiga nebigiis aan Rabbiga wax ka weyddiinnee?
Oo mid ka mid ah boqorkii dalka Israa'iil addoommadiisii
ayaa ugu jawaabay, Waxaa jooga Eliishaa ina Shaafaad
oo biyo ku shubi jiray Eliiyaah gacmihiisii. 12 Markaasaa
Yehooshaafaad wuxuu yidhi, Isaga Eraygii Rabbigaa la jira.
Kolkaasay boqorkii dalka Israa'iil, iyo Yehooshaafaad, iyo
boqorkii Edomba isagii u tageen. 13 Markaasaa Eliishaa
wuxuu boqorkii dalka Israa'iil ku yidhi, War maxaa inaga
dhexeeya? Nebiyadii aabbahaa iyo nebiyadii hooyadaa u tag.
Oo boqorkii dalka Israa'iilna wuxuu ku yidhi, Maya, waayo,
Rabbigu wuxuu saddexdayadan boqor isugu yeedhay inuu
gacanta reer Moo'aab na geliyo. 14 Oo Eliishaana wuxuu
yidhi, Waxaan ku dhaartay Rabbiga ciidammada oo aan hor
taagnahay noloshiisa ee hubaal haddii aanan xurmaynayn
horjoogidda Yehooshaafaad oo ah boqorka dalka Yahuudah,
xaggaaga ma aanan fiiriyeen kuna arkeen. 15 Haddaba
waxaad ii keentaan nin kataarad wada. Oo markii ninkii
kataaraddii ka dhawaajiyey ayaa gacantii Rabbigu ku soo
degtay isagii. 16 Oo wuxuu yidhi, Rabbigu wuxuu idinku
leeyahay, Dooxadan boholo miidhan ka dhiga. 17 Waayo,
waxaa Rabbigu leeyahay, Dabayl ma arki doontaan, roobna
ma arki doontaan, laakiin dooxadaas waxaa ka buuxsami
doona biyo, oo idinna waad cabbi doontaan idinka, iyo
lo'diinna, iyo xoolihiinnuba. 18 Oo taasu Rabbiga hortiisa
waa ku fudud dahay; oo weliba isagu reer Moo'aabna
gacantiinnuu soo gelin doonaa. 19 Oo waa inaad dumisaan
magaalo kasta oo deyr leh, iyo magaalo kasta oo la doortay,
oo geed kasta oo wanaagsan waa inaad jartaan, oo waxaad
xidhaan ilo walba oo biyo ah, oo waxaad dhul kasta oo
wanaagsan ku hallaysaan dhagaxyo. 20 Oo subaxdii dambe
markii allabariga la bixin jiray goor ku dhow ayaa biyo
ka yimaadeen xagga Edom, oo waddankiina biyaa ka
buuxsamay. 21 Haddaba markay reer Moo'aab maqleen in
boqorradii ay yimaadeen inay la dagaallamaan ayaa waxaa
is-urursaday dhammaan kuwii hub qaadi karay iyo kuwii ka
weynaa, oo waxay istaageen soohdinta. 22 Oo iyana waxay
kaceen aroor hore, oo qorraxdiina biyihii bay dhalaalisay, oo
reer Moo'aabna waxay arkeen biyihii hortooda ka muuqday
oo guduudan sida dhiig oo kale. 23 Markaasay yidhaahdeen,
War waxanu waa dhiig, hubaal boqorradii waa islaayeen oo
nin waluba saaxiibkiis buu dilay; haddaba, reer Moo'aabow,
xagga dhaca u kaca. 24 Oo markay yimaadeen xeradii
dadka Israa'iil ayaa dadka Israa'iil ku kaceen oo laayeen
reer Moo'aab; iyana way ka carareen hortooda, oo dadka
Israa'iilna dhulkii bay hore u galeen iyagoo reer Moo'aab
laynaya. 25 Oo magaalooyinkii way burburiyeen, oo dhul
kasta oo fiicanna nin waluba dhagaxiisii buu ku tuuray,
oo way buuxiyeen; oo ilihii biyaha ahaa oo dhanna way
wada xidheen, oo geedihii wanaagsanaa oo dhanna way
wada jareen, ilaa ay Qiir Xaresed oo keliya dhagxanteedii u
daayeen, habase yeeshee wadhafleydii ayaa isku wareejisay
oo ku dhufatay. 26 Oo boqorkii reer Moo'aab markuu arkay
in dagaalku ku kulul yahay ayuu kaxaystay toddoba boqol
oo nin ee seefqaad wada ah si uu ugu gudbo xagga boqorka
Edom, laakiinse way kari waayeen. 27 Markaasuu kaxaystay
wiilkiisii curadka ahaa oo meeshiisa boqor ka noqon lahaa,
oo derbiga korkiisa ayuu sida allabari la gubo ugu bixiyey.
Oo dadka Israa'iilna cadho weyn baa loo qabay, oo iyana
way ka tageen isagii, oo waxay ku noqdeen dalkoodii.

4 Haddaba waxaa Eliishaa u qaylisay naag u dhaxday
qoonkii nebiyada ahaa midkood, oo waxay ku tidhi,
Ninkaygii oo addoonkaaga ahaa waa dhintay, oo adna waad
og tahay inuu addoonkaagu Rabbiga ka cabsan jiray. Oo nin
deyn nagu lahaa ayaa u yimid inuu labadayda carruurta ah
iga qaato oo addoommo ka dhigto. 2 Markaasaa Eliishaa
wuxuu iyadii ku yidhi, Bal ii sheeg, maxaan kuu sameeyaa?
Oo maxaad guriga ku haysataa? Iyana waxay tidhi, Anigoo
addoontaada ah guriga waxba iima yaalliin dheri saliid
ah mooyaane. 3 Oo isna wuxuu ku yidhi, Tag, oo weelal
weyddiiso derisyadaada oo dhan, oo ha ahaadeen weelal
madhan, wax yarna ha soo weyddiisan. 4 Oo waa inaad
gurigaaga gashaa oo adiga iyo wiilashaadu albaabka isku
soo xidha, oo markaas weelashaas saliidda ku shub, oo intii
buuxsanta oo dhan gees u dhig. 5 Sidaas daraaddeed isagii
way ka tagtay, oo iyadii iyo wiilasheedii albaabkii bay isku
soo xidheen, oo iyaguna weelashii bay u keenkeeneen, iyana
way ku shubtay. 6 Oo markii weelashii ay wada buuxsameen
ayay wiilkeedii ku tidhi, Weliba weel kale ii keen. Markaasuu
ku yidhi, Weel dambe ma hadhin. Dabadeedna saliiddii
way joogsatay. 7 Markaasay soo kacday, oo waxay u soo
sheegtay ninkii Ilaah, oo isna wuxuu ku yidhi, Tag oo saliidda
iibi, oo deynkaagii ku bixi, oo adiga iyo wiilashaaduna
inta hadha ku noolaada. 8 Oo waxaa maalin dhacday in
Eliishaa Shuuneem tegey, oo halkaasna waxaa joogtay naag
weyn, oo iyana waxay isagii yeelsiisay inuu wax cuno. Oo

haddana mar alla markuu soo ag maray ayuu xaggeeda
u leexday inuu wax ka cuno. 9 Markaasay ninkeedii ku
tidhi, Bal eeg, waxaan gartay in ninkan oo had iyo goor
ina soo ag maraa uu yahay nin Ilaah oo quduus ah. 10
Haddaba waan ku baryayaaye aynu isaga derbiga uga
samayno qol yar, oo halkaas u dhigno sariir, iyo miis, iyo
kursi, iyo laambad; oo waxay ahaan doontaa markuu inoo
yimaadoba inuu halkaas ku leexdo. 11 Oo waxaa maalin
dhacday inuu halkaas yimid oo intuu qolkii ku leexday ayuu
halkaas jiifsaday. 12 Oo markaasuu midiidinkiisii Geexasii
ku yidhi, U yeedh naagtan reer Shuuneem. Oo markuu
u yeedhay ayay hortiisii soo istaagtay. 13 Markaasuu ku
yidhi isagii, Hadda waxaad iyada ku tidhaahdaa, Adigu aad
baad noo xannaanaysay, haddaba maxaa laguu sameeyaa?
Ma doonaysaa in laguula hadlo boqorka ama sirkaalka
ciidanka? Markaasay ku jawaabtay, Anigu waxaan dhex
degganahay dadkaygii. 14 Oo isna wuxuu yidhi, Haddaba
maxaa loo sameeyaa iyada? Kolkaasaa Geexasii wuxuu ku
jawaabay, Runtii iyadu wiil ma leh, oo ninkeeduna waa oday.
15 Markaasuu ku yidhi, Bal iyada u yeedh. Oo markuu u
yeedhay ayay albaabka soo istaagtay. 16 Oo isna wuxuu
yidhi, Markii wakhtigu soo wareego xilligan oo kale wiil baad
laabta ku qabsan doontaa, oo iyana waxay tidhi, Maya
sayidkaygiiyow, oo adigu nin yahow Ilaah anoo addoontaada
ah been ha ii sheegin. 17 Oo naagtiina way uuraysatay, oo
wiil bay dhashay markii wakhtigii soo wareegay, oo waxay
noqotay sidii Eliishaa iyada ku yidhi. 18 Oo wiilkii markuu
koray waxaa maalin dhacay inuu aabbihiis u tegey meeshii
kuwa beeraha gooyaa ay joogeen. 19 Oo wuxuu aabbihiis
ku yidhi, Madaxa madaxa! Oo isna wuxuu addoonkiisii ku
yidhi, War qaad, oo hooyadiis u gee. 20 Oo markuu soo
qaaday oo hooyadiis u keenay, tan iyo duhurkii ayuu jilbaha
hooyadiis ku fadhiyey, dabadeedna wuu dhintay. 21 Oo
iyana kor bay u baxday, oo waxay isagii ku jiifisay sariirtii
ninkii Ilaah, oo intay albaabkii ku xidhay ayay ka baxday. 22
Markaasay ninkeedii u dhawaaqday oo ku tidhi, Waan ku
baryayaaye iigu cid dir midiidinnadii midkood iyo dameerihii
midkood, si aan ninkii Ilaah ugu ordo oo aan haddana
u soo noqdo. 23 Oo isna wuxuu ku yidhi, Naa maxaad
maanta ugu tegaysaa? Maanta bil cusub ma aha, sabtina
ma aha. Oo iyana waxay tidhi, War way hagaagi doontaa.
24 Markaasay dameer kooraysatay, oo midiidinkeedii waxay
ku tidhi, Igu kaxee oo hore u soco, oo anigoo kugu amra
mooyaane ha i raajin. 25 Saas daraaddeed way tagtay, oo
waxay ninkii Ilaah ugu timid Buur Karmel. Oo markii ninkii
Ilaah iyadii meel fog ka arkay ayuu midiidinkii Geexasii ku
yidhi, Bal eeg waxaa soo socota tii reer Shuuneem. 26
Haddaba waan ku baryayaaye ku orod oo ka hor tag, oo
waxaad ku tidhaahdaa, Ma nabad qabtaa? Ninkaagiina ma
nabad qabaa? Wiilkaagiina ma nabad qabaa? Oo iyana
waxay ugu jawaabtay, Waa nabad. 27 Oo markay ninkii Ilaah
buurta ugu timid ayay cagihiisii qabsatay. Oo Geexasii baa u
soo dhowaaday inuu ka durkiyo, laakiinse ninkii Ilaah baa
yidhi, War iska daa, waayo, nafteedu way welwelsan tahay,
oo Rabbiguna taas wuu iga qariyey, iimana sheegin. 28
Markaasay tidhi, War ma Rabbigaan wiil ka doonay? Sow
kuma aan odhan, War hay khiyaanayn? 29 Oo isna wuxuu
Geexasii ku yidhi, War guntiga isku giiji, oo ushayda gacanta
ku qabso oo tag, oo haddaad qof la kulantid, ha salaamin, oo
haddii qof ku salaamana, ha u jawaabin, oo ushayda waxaad
saartaa wiilka wejigiisa. 30 Oo wiilkii hooyadiis waxay tidhi,
Waxaan ku dhaartay Rabbiga noloshiisa iyo adiga naftaadee
inaanan kaa tagayn. Markaasuu kacay oo raacay. 31 Oo
Geexasiina wuu ka sii hor maray, oo ushii saaray wiilka
wejigiisii, laakiinse cod iyo wax maqlid toona laguma arag.
Sidaas daraaddeed wuu noqday oo intuu ka hor yimid ayuu
u warramay, oo ku yidhi, Yarkii ma uu toosin. 32 Oo Eliishaa
markuu gurigii soo galay ayuu arkay in yarku meyd yahay, oo
uu sariirtiisii ku jiifo. 33 Sidaas daraaddeed guduhuu galay oo
intuu labadoodiiba albaabkii ku xidhay ayuu Rabbiga baryay.
34 Markaasuu intuu kacay ayuu yarkii ku kor jiifsaday, oo
afkuu afka u saaray, indhihiina indhuhuu u saaray, gacmihiina
gacmuhuu u saaray; oo korkiisuu isku fidiyey; markaasaa
yarka jidhkiisii soo diiray. 35 Markaasuu noqday oo guriga
dhexdiisii mar ayuu hore iyo dib ugu socday, oo intuu tegey
ayuu haddana yarkii isku fidiyey, markaasaa yarkii toddoba
goor hindhisay oo indhaha kala qaaday. 36 Markaasuu
Geexasii u yeedhay, oo wuxuu ku yidhi, Tii reer Shuuneem u
yeedh. Oo isna wuu u soo yeedhay. Oo markay gudaha ugu
soo gashay ayuu ku yidhi, Wiilkaaga qaado. 37 Markaasay
gudaha soo gashay, oo cagihiisii ku dhacday, oo dhulkay
ku sujuudday, markaasay wiilkeedii qaadatay oo dibadda u
baxday. 38 Oo Eliishaa haddana wuxuu yimid Gilgaal; oo
wakhtigaasna dalku abaar buu ahaa, oo isagana waxaa
hortiisa fadhiyey qoonkii nebiyada ahaa; oo isna midiidinkiisii
ayuu ku yidhi, Dheriga weyn dabka saar oo qoonka nebiyada
ah maraq u kari. 39 Oo midba berrinka u baxay inuu khudaar
soo guro aawadeed, oo wuxuu helay geed duureed, oo
ubbodibadeedyona faraquu ka soo buuxsaday, oo intuu soo
noqday ayuu dherigii maraqa ku googooyay, waayo, ma ay
garanayn. 40 Sidaas daraaddeed raggii bay u soo gureen
inay cunaan aawadeed. Oo intay maraqii cunayeen ayay
qayliyeen, oo yidhaahdeen, War nin yahow Ilaah, dheriga
geeri baa ku jirta! Maraqiina way cuni kari waayeen. 41

Laakiinse isagii wuxuu yidhi, War bal jidhiidh ii keena. Oo
kolkay u keeneen ayuu dherigii ku dhex riday, oo wuxuu ku
yidhi, War maraqa dadka u shub ha cuneene. Oo dherigiina
waxba waxyeello laguma arag. **42** Oo nin baa xagga Bacal
Shalishaah ka yimid, oo wuxuu ninkii Ilaah kolaygiisii ugu
keenay cunto midhihii hore ah, taas oo ah labaatan kibsood
oo shaciir ah iyo sabuullo arabikhi oo qoyan. Oo wuxuu
ku yidhi, War kuwan dadku ha cuneene sii. **43** Markaasaa
midiidinkiisii wuxuu ku yidhi, War waa sidee, ma intanaan
boqol nin hor dhigaa? Laakiinse isagii wuxuu yidhi, Dadku
ha cuneene sii; waayo, Rabbigu wuxuu leeyahay, Way cuni
doonaan, oo weliba wax bay reebi doonaan. **44** Sidaas
daraaddeed hortoodii buu dhigay, oo iyana way cuneen oo
weliba wax bay u reebeen sidii erayga Rabbigu ahaa.

**5** Haddaba Nacamaan oo ahaa sirkaalkii ciidanka boqorka
Suuriya wuxuu ahaa nin xagga sayidkiisa ku weyn oo
ciso leh, maxaa yeelay, isaga ayaa Rabbigu reer Suuriya
lib ku siiyey; oo weliba wuxuu ahaa nin xoog leh, laakiinse
baras buu qabay. **2** Oo reer Suuriyana guutooyin bay ku
baxeen, oo waxay dalkii Israa'iil ka soo dhaceen gabadh yar,
oo iyana Nacamaan bilcantiisa ayay u adeegi jirtay. **3** Oo
waxay sayidaddeedii ku tidhi, Hoogay, haddii sayidkaygu hor
tegi lahaa nebiga Samaariya jooga wuu ka bogsiin lahaa
baraskan. **4** Oo mid baa sayidkiisii u galay oo ku yidhi,
Gabadhii dalka Israa'iil ka timid saas iyo saas bay tidhi. **5**
Markaasaa boqorkii Suuriya wuxuu Nacamaan ku yidhi,
War orod oo tag, oo anna warqad baan kuugu sii dhiibayaa
boqorka dalka Israa'iil. Oo isna wuu tegey, oo wuxuu qaaday
toban talanti oo lacag ah, iyo lix kun oo sheqel oo dahab ah,
iyo toban iskujoog oo dhar ah. **6** Oo wuxuu u keenay boqorkii
dalka Israa'iil warqaddii lahayd, Haddaba markii warqaddanu
kuu timaado, bal eeg, addoonkayga Nacamaan ah ayaan
kugu soo diray si aad baraska uga bogsiisid. **7** Oo markii
boqorkii dalka Israa'iil warqaddii akhriyey ayuu dharkiisii
iska jeexjeexay oo wuxuu yidhi, War ma anigaa ah Ilaah
wax dili kara, waxna noolayn kara? Oo ninkanu ma saasuu
nin iigu soo diray si aan baraska uga bogsiiyo? Waan idin
baryayaaye bal u fiirsada siduu ii daandaansanayo. **8** Oo
markii Eliishaa oo ahaa nin Ilaah uu maqlay in boqorkii dalka
Israa'iil dharkiisii iska jeexjeexay ayuu u cid diray boqorkii oo
ku yidhi, War maxaad dharkaagii isaga jeexjeexday? Bal
isagu ha ii yimaado, oo wuxuu ogaan doonaa in dalka Israa'iil
nebi dhex joogo. **9** Markaasaa Nacamaan yimid, isagoo
wata fardihiisii iyo gaadhifardoodkiisii, oo wuxuu soo hor
istaagay albaabkii gurigii Eliishaa. **10** Oo Eliishaa wargeeyuu
u diray oo wuxuu ku yidhi, Tag oo Webi Urdun toddoba jeer
ku maydho, oo jiidhkaagu mar kaluu kuu soo noqon doonaa,
oo nadiif baad ahaan doontaa. **11** Laakiinse Nacamaan wuu
cadhooday oo tegey, oo wuxuu yidhi, Bal eega, waxaan
mooday inuu isaga qudhiisu ii soo baxayo oo istaagayo,
oo uu magaca Rabbiga Ilaahiisa ah iigu ducaynayo, oo
uu gacantiisa meesha bukta dul marmarinayo, oo uu saas
baraska ku bogsiinayo. **12** War Abaanaah iyo Farfar oo ah
webiyadii Dimishaq sow kama wanaagsana biyaha dalka
Israa'iil oo dhan? Bal miyaanan iyaga ku maydhan karin
oo nadiif ahaan karin? Sidaas daraaddeed wuu noqday, oo
wuxuu tegey isagoo cadhaysan. **13** Laakiinse addoommadiisii
ayaa u yimid oo la hadlay, oo waxay ku yidhaahdeen,
Aabbow, haddii nebigu wax weyn kugu amro sow ma aadan
samayseen? Haddaba bal maxaa ka sahlan hadduu kugu
yidhaahdo, Maydho, oo nadiif noqo? **14** Markaasuu tegey, oo
sidii ninkii Ilaah isaga ku yidhi ayuu yeelay, oo Webi Urdun
ayuu toddoba jeer liimbaday; oo jiidhkiisiina mar kaluu u soo
noqday isagoo u eg ilmo yar jiidhkiis, nadiif buuna noqday. **15**
Markaasuu ninkii Ilaah ku noqday, oo isagii iyo kooxdiisii oo
dhammuba, intay yimaadeen ayay hortiisii soo istaageen; oo
isna wuxuu yidhi, Bal eeg, haatan waan ogahay inaan dunida
oo dhan Ilaah lagu arag dalka Israa'iil mooyaane, haddaba
sidaas daraaddeed waxaan kaa baryayaa inaad qaadato
hadiyaddayda anoo addoonkaaga ah. **16** Laakiinse Eliishaa
wuxuu yidhi, Waxaan ku dhaartay nolosha Rabbiga aan hor
taagnahaye inaanan waxba kaa qaadanayn. Oo isna wuu ku
sii cadaadiyey inuu qaato, laakiinse Eliishaa wuu diiday. **17**
Markaasaa Nacamaan wuxuu yidhi, Haddii ayan saas ahayn
weliba waxaan kaa baryayaa in anigoo addoonkaaga ah lay
siiyo ciid intii ay laba baqal qaadi karaan, waayo, anigoo
addoonkaaga ah, hadda ka dib Rabbiga mooyaane ilaahyo
kale u bixin maayo qurbaan la gubo iyo allabari toona. **18** Oo
waxakanna Rabbigu ha iga cafiyo anigoo addoonkaaga ah,
markii sayidkaygu guriga Rimmon u tago inuu ku tukado,
oo uu ku tiirsada gacantayda ee aan anna ku sujuudo
guriga Rimmon gudihiisa, oo markaan ku sujuudo guriga
Rimmon gudihiisa Rabbigu anigoo addoonkaaga ah ha iga
cafiyo waxakan. **19** Oo isna wuxuu isagii ku yidhi, Orod oo
nabad ku tag. Sidaas daraaddeed in yar buu ka socday.
**20** Laakiinse Geexasii oo ahaa midiidinkii Eliishaa oo ahaa
ninkii Ilaah wuxuu yidhi, Bal eega, sayidkaygu wuu u tudhay
Nacamaan kii reer Suuriya, oo wixii uu u keenayna waxba
kama uu qaadan. Waxaan Rabbiga noloshiisa ugu dhaartay
inaan intaan isagii ka daba ordo wax ka soo qaato. **21**
Sidaas daraaddeed Geexasii wuxuu daba galay Nacamaan.
Oo Nacamaanna markuu arkay mid soo daba ordaya ayuu
gaadhifaraskiisii ka soo degtay inuu ka hor tago, oo wuxuu
ku yidhi, War ma nabad baa? **22** Oo isna wuxuu ku yidhi,

Waa nabad. Oo sayidkaygii baa i soo diray oo wuxuu kugu
soo yidhi, Haddeerba waxaa ii yimid laba nin oo dhallinyar oo
qoonkii nebiyada ah oo ka yimid dalka buuraha leh oo reer
Efrayim; haddaba waxaan kaa baryayaa inaad iyaga siiso
talanti lacag ah iyo laba iskujoog oo dhar ah. **23** Markaasaa
Nacamaan yidhi, Oggolow oo qaad laba talanti oo lacag ah.
Wuuna ku sii adkeeyey, oo labadii talanti wuxuu ugu xidhay
laba kiish, oo wuxuu ugu sii daray laba iskujoog oo dhar ah,
oo weliba wuxuu u saaray laba midiidinnadiisii ah, oo iyana
intay u qaadeen ayay hortiisa socdeen. **24** Oo markuu buurtii
yimid ayuu gacmahoodii ka qaaday, oo guriguu dhigtay;
nimankiina wuu iska diray oo way tageen. **25** Oo isagiina
intuu gudaha galay ayuu sayidkiisii hor istaagay. Markaasaa
Eliishaa ku yidhi, Geexasiiyow, xaggee baad ka timid? Isna
wuxuu yidhi, Anigoo addoonkaaga ahu meella ma tegin. **26**
Oo isna wuxuu isagii ku yidhi, War sow qalbigaygu kulama
socon markii ninku gaadhifaraskiisii ka soo noqday inuu kaa
hor yimaado? War haatan ma wakhti lacag la qaataa oo ma
wakhti la qaataa dhar, iyo beero saytuun ah, iyo beero canab
ah, iyo ido, iyo dibi, iyo niman addoommo ah, iyo naago
addoommo ah? **27** Haddaba waxaa adiga iyo farcankaagaba
idinku dhegi doona weligiin Nacamaan baraskiisii. Oo wuxuu
hortiisii ka tegey isagoo baras qaba oo u cad sida baraf cad
oo kale.

**6** Oo qoonkii nebiyada ahaana waxay Eliishaa ku
yidhaahdeen, Bal eeg, meesha hortaada ah ee aannu
deggan nahay waa nagu cidhiidhi. **2** Haddaba waannu ku
baryaynaaye aannu tagno xagga Urdun oo halkaas nin
waluba dogob ha ka qaado, oo aannu halkaas ka dhisanno
meel aan degno. Oo isna wuxuu ugu jawaabay, Orda
oo taga. **3** Oo midba wuxuu yidhi, Waan ku baryayaaye
raalli ahow oo na raac annagoo addoommadaada ah. Oo
isna wuxuu ugu jawaabay, Waan idin raacayaa. **4** Sidaas
daraaddeed wuu raacay. Oo iyana markay Urdun yimaadeen
ayay geedo jareen. **5** Laakiinse midba intuu qori jarayay
ayaa faaskii intii birta ahayd biyihii ku dhex dhacday, oo
isna intuu qayliyey ayuu yidhi, Sayidkaygiiyow, hoogay!
Waayo, deyn buu igu ahaa. **6** Markaasaa ninkii Ilaah wuxuu
yidhi, War xaggee bay ku dhacday? Oo isna markaasuu
meeshii tusay. Markaasuu ul soo goostay oo meeshii ku
riday, birtiina waa soo dabaalatay. **7** Wuxuuna yidhi, War
haddaba soo qaado. Sidaas daraaddeed gacantii buu fidiyey
oo soo qaatay. **8** Haddaba boqorkii Suuriya wuxuu la diriray
dadkii Israa'iil, oo intuu addoommadiisii la tashaday ayuu ku
yidhi, Meesha saa iyo saa ah ayaa xeradaydu ahaan doonta.
**9** Markaasaa ninkii Ilaah u cid diray boqorkii dalka Israa'iil oo
wuxuu ku yidhi, War iska jir oo ha soo marin meesha saas
ah, waayo, reer Suuriya meeshaasay ku dhaadhacayaan. **10**
Oo boqorkii dalka Israa'iilna cid buu u diray meeshii ninkii
Ilaah isaga u sheegay oo uu uga digay, oo isna intuu halkaas
iska nabadgeliyey mar iyo laba toona ma aha. **11** Oo boqorkii
Suuriyana qalbigiisu waxyaalahan aad buu uga welwelsanaa;
oo wuxuu isugu yeedhay addoommadiisii, oo ku yidhi, War
maad ii sheegtaan midkeenna la jira boqorkii dalka Israa'iil?
**12** Markaasaa mid addoommadiisii ka mid ahu wuxuu ku
yidhi, Boqorow, sayidkaygiiyow, saas ma aha; laakiinse
Eliishaa oo ah nebi dalka Israa'iil dhex jooga ayaa boqorka
dadka Israa'iil u sheega erayada aad kaga hadasho qolkaaga
aad seexato. **13** Oo isna wuxuu ku yidhi, Tag oo soo arag
meeshuu joogo si aan isaga ugu cid diro ha la soo qabtee.
Oo waxaa loo sheegay oo lagu yidhi, War wuxuu joogaa
Dotaan. **14** Sidaas daraaddeed wuxuu halkaas u diray fardo,
iyo gaadhifardood, iyo ciidan faro badan; oo iyana intay
habeennimo yimaadeen ayay magaaladii hareereeyeen. **15**
Oo ninkii Ilaah shaqeeyihiisii markuu aroortii soo toosay
oo uu baxay, bal eeg, waxaa la arkay ciidan fardo iyo
gaadhifardood wata oo magaaladii ku wareegsan. Markaasaa
midiidinkiisii wuxuu isagii ku yidhi, Sayidow, hoogaye! sidee
baynu yeeli doonnaa? **16** Oo isna wuxuu ugu jawaabay,
Ha cabsan, waayo, kuwa inala jiraa way ka sii badan yihiin
kuwa iyaga la jira. **17** Markaasaa Eliishaa baryootamay
oo yidhi, Rabbiyow, waxaan kaa baryayaa inaad ninkan
indhaha u furtid wax ha arkee. Markaasaa Rabbigu ninkii
dhallinyarada ahaa indhihii u furay, wax buuna arkay; oo
wuxuu u jeeday fardo iyo gaadhifardood dab ah oo buurta
ka buuxa ee Eliishaa ku wareegsan. **18** Oo iyana markay
isagii u soo dhaadhaceen ayaa Eliishaa Rabbiga baryay
oo yidhi, Rabbiyow, waxaan kaa baryayaa inaad dadkan
indhabbeel ku riddid. Oo isna indhabbeel ayuu ugu riday
sidii eraygii Eliishaa u ahaa. **19** Markaasaa Eliishaa wuxuu
iyagii ku yidhi, War jidkanu ma aha jidkii, magaaladanuna
ma aha magaaladii. Haddaba i soo raaca oo waxaan idiin
geeynayaa ninkaad doonaysaan. Oo isna wuxuu u hor kacay
xagga Samaariya. **20** Oo markay Samaariya soo galeen
ayaa Eliishaa yidhi, Rabbiyow, nimankan indhaha u fur, wax
ha arkeene. Kolkaasaa Rabbigu indhaha u furay, wax bayna
arkeen, oo waxay u jeedeen inay Samaariya dhex joogaan.
**21** Markaasaa boqorkii dalka Israa'iil wuxuu Eliishaa ku
yidhi markuu nimankii arkay, Aabbahayow, miyaan laayaa?
Miyaan laayaa? **22** Oo isna wuxuu ugu jawaabay, Maya,
waa inaadan layn. Ma layn lahayd kuwaad ku soo qabsatay
seeftaada iyo qaansadaada? Waxaad soo hor dhigtaa kibis
iyo biyo ay cunaan oo ay cabbaan, oo dabadeedna ha u

tageen sayidkoodii. 23 Markaasuu wuxuu iyagii u diyaariyey cunto badan, oo markay wax cuneen oo wax cabbeen ayuu iska diray, oo sayidkoodii bay u tageen. Oo guutooyinkii reer Suuriyana mar dambe ma soo gelin dalkii Israa'iil. 24 Oo taas dabadeed Benhadad oo ahaa boqorkii Suuriya wuxuu soo wada urursaday ciidankiisii oo dhan, oo intuu soo kacay ayuu Samaariya hareereeyey. 25 Oo Samaariyana abaar weyn baa ku dhacday, oo bal eeg iyana waxay hareeraha ka joogeen ilaa madax dameer lagu iibiyey siddeetan sheqel oo lacag ah, oo qab rubuciis digo qolley ahna lagu iibiyey shan sheqel oo lacag ah. 26 Oo boqorkii dalka Israa'iil oo derbiga dul maraya ayaa naagu u qayshatay oo ku tidhi, Boqorow, sayidkaygiiyow, i caawi. 27 Oo isna wuxuu ku yidhi, Naa haddii uusan Rabbigu ku caawin, anigu xaggee baan kaa caawinayaa? Naa ma waxaan kaa caawinayaa meesha hadhuudhka lagu tumo; mase meesha canabka lagu tuujiyo? 28 Markaasaa boqorkii wuxuu iyadii ku yidhi, Naa maxaa ku helay? Oo iyana waxay ugu jawaabtay, Naagtan waxay igu tidhi, Naa wiilkaaga na sii aan maanta cunnee oo wiilkaygana berri baannu wada cuni doonnaa. 29 Sidaas daraaddeed wiilkaygii waan karsannay oo waannu cunnay; markaasaan maalintii dambe iyadii ku idhi, Naa wiilkaagii na sii aan cunnee; laakiinse iyadu way qarisay wiilkeedii. 30 Oo markii boqorkii naagtii hadalkeedii maqlay ayuu dharkiisii dildillaaciyey; (oo markaas wuxuu dul marayay derbiga), oo dadkiina way wada arkayeen inuu jidhkiisii ku guntaday joonyado. 31 Oo markaasuu yidhi, Ilaah saas iyo si ka sii daranba ha igu sameeyo, haddii Eliishaa ina Shaafaad madaxiisu maanta ku sii yaallo. 32 Oo Eliishaana markaas wuxuu dhex fadhiyey gurigiisii, oo odayaashiina way la fadhiyeen; oo boqorkiina nin buu iska soo hor mariyey; laakiinse ninkii wargeeyska ahaa intuusan isagii u iman ayuu Eliishaa odayaashii ku yidhi, War bal eega siduu kan gacankudhiigluhu dhalay cid ugu soo diray in madaxa layga gooyo? War markii wargeeysku yimaado albaabka xidha, oo dib ugu celiya albaabka. War waxa ka dambeeya sow ma aha sanqadhii cagihii sayidkiisa? 33 Oo intuu iyagii weli la hadlayay ayaa wargeeyskii u soo dhaadhacay; oo isna wuxuu yidhi, Belaayadanu xagga Rabbigay ka timid; haddaba maxaan Rabbiga weli u sii sugaa?

**7** Markaasaa Eliishaa yidhi, War maqla erayga Rabbiga. Rabbigu wuxuu leeyahay, Berrito hadda oo kale Samaariya iriddeeda koombo bur ah waxaa lagaga iibin doonaa sheqel, oo laba koombo oo shaciir ahna waxaa lagaga iibin doonaa sheqel. 2 Oo sirkaalkii gacantiisa boqorku ku tiirsanaa wuxuu ninkii Ilaah ugu jawaabay, Rabbiga oo samada daaqado ka fura mooyaane, ee sidee baa waxanu ku noqon karaan? Oo isna wuxuu ku yidhi, Bal ogow, indhahaaga ayaad ku arki doontaa, laakiinse waxba kama cuni doontid. 3 Haddaba iridda magaalada laga soo galo waxaa joogay afar nin oo baras qabay; oo iyana midba kii kaluu ku yidhi, War maxaynu halkan u fadhinnaa ilaa aynu ka dhimanno? 4 Haddaynu nidhaahno, Aan magaalada galno, de markaasna magaaladii waa abaar, oo kolleyba halkaasaynu ku dhimanaynaa. Oo haddaynu halkan iska fadhinnona waynu dhimanaynaa. Haddaba ina keena oo aynu ciidanka Suuriya u baxno; oo hadday na bixiyaan, waynu noolaan, hadday na dilaanna kolleyba waynu dhiman lahayn. 5 Oo markaasay fiidkii kaceen inay tagaan xeradii ciidanka Suuriya, oo markay yimaadeen dibadda sare oo xeradii ciidankii Suuriya waxay arkeen inaan ciduna halkaas joogin. 6 Maxaa yeelay, Sayidku wuxuu ciidankii Suuriya maqashiiyey gaadhifardood sanqadhood, iyo fardo sanqadhood, iyo xataa ciidan weyn sanqadhiis; oo waxay isku yidhaahdeen, War boqorkii dalka Israa'iil wuxuu inoo soo kiraystay boqorradii reer Xeed, iyo boqorradii Masar inay inagu soo duulaan. 7 Sidaas daraaddeed way kaceen oo carareen intay fiidkii ahayd. Waxayna ka tageen teendhooyinkoodii, iyo fardahoodii, iyo dameerahoodii, iyo xataa xeradiina siday ahayd; naftoodiina way la carareen. 8 Oo kuwii baraska qabayna markay yimaadeen xeradii dibaddeeda sare ayay teendho galeen, oo wax bay cuneen, waxna way cabbeen, markaasay halkaas ka qaateen lacag, iyo dahab, iyo dhar, oo intay tageen ayay soo qarsadeen; oo haddana way soo noqdeen oo waxay galeen teendho kale, oo halkaasna wax kalay ka qaateen, oo intay tageen ayay soo qarsadeen. 9 Markaasay isku yidhaahdeen, War wax wanaagsan ma samaynayno, waayo, maanta waa maalin war wanaagsan, oo annana waynu iska aamusan nahay. Haddaynu sugno ilaa waagu ka beryo hubaal belaayo baa inagu dhici doonta; haddaba ina keena oo aynu xaalkan reerkii boqorka u soo sheegno. 10 Sidaas daraaddeed way yimaadeen, oo waxay u dhawaaqeen magaalada iridjoogayaasheedii; oo way u warrameen oo waxay ku yidhaahdeen, Waxaannu galnay xeradii ciidanka Suuriya, oo halkaas ninna ma joogin, codna laguma maqal, laakiinse waxaa joogay fardihii xidhxidhnaa, iyo dameerihii xidhxidhnaa, iyo teendhooyinkii oo sidoodii iska ahaa. 11 Oo isna wuxuu u yeedhay iridjoogayaashii, oo iyana waxay saas u soo sheegeen reerkii boqorka ee gudaha joogay. 12 Markaasaa boqorkii habeennimadii toosay oo addoommadiisii ku yidhi, Haatan waxaan idin tusayaa wixii ay reer Suuriya nagu sameeyeen. Iyagu way og yihiin inaynu gaajaysan nahay, oo sidaas daraaddeed xeradii way ka

baxeen oo duurka ku dhuunteen, oo waxay isyidhaahdeen,
Markay magaalada ka soo baxaan ayaynu iyagoo noolnool
qabqabanaynaa, oo magaalada ayaynu galaynaa. 13 Oo mid
addoommadiisii ka mid ahaa ayaa ugu jawaabay, Waxaan
kaa baryayaa in qaar wado shan faras oo kuwa magaalada
ku hadhay ah, (maxaa yeelay, iyagu waxay la mid yihiin
sida dadkii Israa'iil ka hadhay oo dhan, oo waxay la mid
yihiin sida dadkii Israa'iil ee le'day oo dhan, ) oo aynu dirno
iyagu ha soo arkeene. 14 Oo sidaas daraaddeed waxay
wadeen laba gaadhifaras iyo fardahoodii; oo boqorkii baa
wuxuu ka daba diray ciidankii Suuriya, oo wuxuu ku yidhi,
Ordoo soo arka. 15 Oo iyana waxay daba socdeen ilaa Webi
Urdun; oo bal eeg jidka oo dhan waxaa ka buuxay dhar iyo
weelal ay reer Suuriya iska xooreen intay degdegayeen. Oo
wargeeyayaashiina intay soo noqdeen ayay saas boqorkii
u soo sheegeen. 16 Markaasaa dadkii baxay oo waxay
dhaceen xeradii reer Suuriya. Haddaba koombo bur ah
waxaa lagu iibiyey sheqel, laba koombo oo shaciir ahna
waxaa lagu iibiyey sheqel, oo waxay noqotay sidii erayga
Rabbigu ahaa. 17 Markaasaa boqorkii sirkaalkii uu gacantiisa
ku tiirsanaa ku amray inuu iridda u taliyo; laakiinse dadkii
baa ku tuntay isagoo iridda jooga, oo wuu dhintay sidii ninkii
Ilaah sheegay kolkii boqorku isaga u soo dhaadhacay. 18 Oo
waxay noqotay sidii ninkii Ilaah boqorkii ula hadlay isagoo
leh, Berrito hadda oo kale Samaariya iriddeeda laba koombo
oo shaciir ah waxaa lagaga iibin doonaa sheqel, koombo bur
ahna waxaa lagaga iibin doonaa sheqel; 19 oo sirkaalkii
baa wuxuu ugu jawaabay ninkii Ilaah, Rabbiga oo samada
daaqado ka fura mooyaane, ee sidee baa waxanu ku noqon
karaan? Oo isna wuxuu ku yidhi, Bal ogow, indhahaaga
waad ku arki doontaa, laakiinse waxba kama cuni doontid.
20 Haddaba isagii sidii baa ku dhacday; maxaa yeelay, isagii
dadkii baa ku tuntay isagoo iridda jooga oo wuu dhintay.

**8** Markaasaa Eliishaa la hadlay naagtii uu wiilkeeda soo
noolaysiiyey oo wuxuu ku yidhi, Sara joogso oo tag, adiga
iyo reerkaagiiba, oo waxaad degtaa meel alla meeshii aad
degi karto, maxaa yeelay, Rabbigu wuxuu amray in dalka
abaaru ku dhacdo, oo waxay dalka joogi doontaa toddoba
sannadood. 2 Markaasaa naagtii sara joogsatay oo yeeshay
sidii eraygii ninkii Ilaah ahaa; oo way tagtay iyada iyo
reerkeediiba oo intii toddoba sannadood ah ayay degganayd
dalkii reer Falastiin. 3 Oo markii toddobadii sannadood
ay dhammaadeen ayay naagtii ka soo noqotay dalkii reer
Falastiin; oo waxay u tagtay boqorkii inay ugu qayshato
gurigeedii iyo dhulkeedii. 4 Markaasna boqorku wuxuu la
hadlayay Geexasii oo ahaa midiidinkii ninkii Ilaah, oo wuxuu
ku lahaa, Waxaan kaa baryayaa inaad ii sheegto waxyaalihii
waaweynaa oo Eliishaa sameeyey oo dhan. 5 Intuu boqorkii
uga warramayay sidii uu u soo noolaysiiyey mid meyd ahaa,
bal eeg, naagtii uu wiilkeeda soo noolaysiiyey ayaa boqorkii
ugu qayshatay gurigeedii iyo dhulkeedii. Oo Geexasiina
wuxuu yidhi, Sayidkaygiiyow, boqorow, tanu waa naagtii,
kanuna waa wiilkeedii Eliishaa soo noolaysiiyey. 6 Oo
boqorkiina markuu naagtii saas weyddiiyey ayay iyana u
sheegtay. Markaasaa boqorkii iyadii u amray sirkaal oo ku
yidhi, U wada celi wax alla wixii ay lahayd oo dhan, iyo
weliba midhihii beerteeda ka baxay tan iyo maalintii ay dalka
ka tagtay iyo ilaa haddeer. 7 Oo Benhadad oo ahaa boqorkii
Suuriya isagoo buka ayaa Eliishaa Dimishaq yimid, oo waa
loo sheegay oo waxaa lagu yidhi, War ninkii Ilaah waa yimid.
8 Markaasaa boqorkii Xasaa'eel ku yidhi, Hadiyad qaad, oo
waxaad ka hor tagtaa ninka Ilaah, oo Rabbiga wax iiga soo
weyddii, oo waxaad ku tidhaahdaa, Boqorku ma cudurkuu
ka bogsanayaa? 9 Markaasaa Xasaa'eel tegey inuu isagii ka
hor tago oo wuxuu qaaday hadiyad ah Dimishaq wax alla
waxeedii wanaagsanaa oo dhan oo afartan rati ku raran, oo
intuu u yimid ayuu soo hor istaagay oo yidhi, Waxaa ii soo kaa
diray wiilkaagii Benhadad oo ah boqorkii Suuriya, oo wuxuu
leeyahay, Miyaan cudurkan ka bogsanayaa? 10 Markaasaa
Eliishaa wuxuu isagii ku yidhi, Tag, oo waxaad ku tidhaahdaa,
Hubaal waad bogsanaysaa; habase yeeshee Rabbigu
wuxuu i tusay inuu hubaal dhimanayo. 11 Oo isna wuu ku
dhaygagay ilaa uu isku yaxyaxay; markaasaa ninkii Ilaah
ooyay. 12 Markaasaa Xasaa'eel ku yidhi, Sayidkaygiiyow,
maxaad u ooyaysaa? Oo isna wuxuu ugu jawaabay, Maxaa
yeelay, waxaan ogahay xumaanta aad dadka Israa'iil ku
samayn doonto; waayo, qalcadahooda dab baad ku dhejin
doontaa, oo raggooda dhallinyarada ahna seef baad ku
wada layn doontaa, oo dhallaankoodana dhulkaad ku tuuri
doontaa, oo naagahooda uurka lehna waad dooxi doontaa.
13 Markaasaa Xasaa'eel yidhi, War sidee baan anigoo
addoonkaaga ah oo aan eey waxba dhaamin waxyaalahan
waaweyn u samayn doonaa? Markaasaa Eliishaa wuxuu
ugu jawaabay, Rabbigu wuxuu i tusay inaad noqon doontid
boqor Suuriya u taliya. 14 Markaasuu Eliishaa ka tegey oo
wuxuu u yimid sayidkiisii isaga ku yidhi, War maxaa Eliishaa
kugu soo yidhi? Oo isna wuxuu ugu jawaabay, Wuxuu ii
sheegay inaad hubaal bogsanaysid. 15 Oo maalintii ku
xigtay ayuu maro qaaday oo biyo dhex geliyey, markaasuu
wejiga boqorka ku deday wuuna dhintay; oo meeshiisiina
Xasaa'eel ayaa boqor ka noqday. 16 Yooraam oo ahaa
ina Axaab boqorkii dalka Israa'iil sannaddiisii shanaad, oo
Yehooshaafaadna dalka Yahuudah boqorka ka ahaa, ayaa

Yehooraam ina Yehooshaafaad dalka Yahuudah boqor ka
noqday. 17 Oo markuu boqor noqday wuxuu jiray laba
iyo soddon sannadood, siddeed sannadoodna boqor buu
ku ahaa Yeruusaalem. 18 Oo wuxuu ku socday jidkii ay
boqorradii dalka Israa'iil mareen, sidii reerkii Axaab yeelay
oo kale, waayo, wuxuu qabay Axaab gabadhiisii; oo wuxuu
sameeyey wax Rabbiga hortiisa shar ku ah. 19 Habase
yeeshee Rabbigu ma uu doonaynin inuu dalka Yahuudah
baabbi'iyo, sababtuna waa addoonkiisii Daa'uud aawadiis,
waayo, wuxuu u ballanqaaday inuu isaga iyo carruurtiisa
had iyo goorba laambad siiyo. 20 Oo wakhtigiisii ayaa reer
Edom ka fallaagoobay dadka Yahuudah, oo iyana waxay
yeesheen boqor u taliya. 21 Markaasaa Yooraam u gudbay
xagga Saaciir, isagoo wata gaadhifardoodkiisii oo dhan;
oo intuu habeennimo kacay ayuu laayay reer Edom oo
hareereeyey isaga iyo saraakiishii gaadhifardoodka, dadkiina
waxay ku carareen teendhooyinkoodii. 22 Reer Edomna
way ka fallaagoobeen oo way ka hoos baxeen gacantii
dadka Yahuudah ilaa maantadan la joogo. Oo haddana
isla markaasba waxaa kaloo ka fallaagoobay reer Libnaah.
23 Oo Yooraam falimihiisii kale iyo wixii uu sameeyey oo
dhammu sow kuma qorna kitaabkii taariikhda boqorradii
dalka Yahuudah? 24 Markaasaa Yooraam dhintay oo la
seexday awowayaashiis, oo waxaa awowayaashiis lagula
aasay magaaladii Daa'uud; oo waxaa meeshiisii boqor ka
noqday wiilkiisii Axasyaah. 25 Oo boqorkii dalka Israa'iil oo
ahaa Yooraam ina Axaab sannaddiisii laba iyo tobnaad ayaa
Axasyaah ina Yehooraam dalka Yahuudah boqor ka noqday.
26 Oo Axasyaah markuu boqor noqday wuxuu jiray laba iyo
labaatan sannadood, oo sannad ayuu Yeruusaalem boqor
ka ahaa. Hooyadiisna magaceeda waxaa la odhan jiray
Catalyaah, oo waxay ahayd ina Coomrii oo ahaa boqorkii
dalka Israa'iil. 27 Oo wuxuu ku socday jidkii reerkii Axaab
maray, oo wuxuu sameeyey wax Rabbiga hortiisa shar ku
ah sidii reerkii Axaab yeelay oo kale, waayo, isaga waxaa
soddog u ahaa Axaab. 28 Oo wuxuu raacay Yooraam oo
ahaa ina Axaab inay Xasaa'eel oo ahaa boqorkii Suuriya
kula diriraan Raamod Gilecaad; oo reer Suuriyana Yooraam
bay dhaawaceen. 29 Oo Boqor Yooraamna wuxuu ku noqday
Yesreceel in laga soo daweeyo nabrihii ay reer Suuriya
Raamaah kaga dhufteen markuu la diriray Xasaa'eel oo
ahaa boqorkii Suuriya. Markaasaa Axasyaah ina Yehooraam
oo ahaa boqorkii dalka Yahuudah Yesreceel tegey inuu soo
arko Yooraam ina Axaab, maxaa yeelay, dhaawac buu ahaa.

9 Markaasaa Eliishaa u yeedhay mid qoonkii nebiyada ka
mid ahaa, oo wuxuu ku yidhi, War guntiga isku giiji, oo
weelkan saliidda ahna gacanta ku sii qaado, oo waxaad
tagtaa Raamod Gilecaad. 2 Oo markaad halkaas tagto
waxaad doondoontaa Yeehuu ina Yehooshaafaad oo ahaa
ina Nimshii, oo u tag oo walaalihiis ka dhex kici, oo intaad
kaxaysid qol hoose la gal. 3 Oo markaas waxaad qaadataa
weelka saliidda ah oo madaxiisa ku shub, oo waxaad
ku tidhaahdaa, Rabbigu wuxuu kugu leeyahay, Waxaan
kuu subkay inaad ahaato boqor u taliya dalka Israa'iil. Oo
markaas intaad albaabka furtid carar oo innaba ha raagin. 4
Sidaas daraaddeed ninkii dhallinyarada ahaa oo nebiga ahaa
wuxuu tegey Raamod Gilecaad. 5 Oo markuu yimid ayuu
arkay saraakiishii ciidanka oo fadhida; oo wuxuu ku yidhi,
Sirkaalow, farriin baan kuu wadaa. Markaasaa Yeehuu yidhi,
Kayagee baad u waddaa? Isna wuxuu yidhi, Adigaan kuu
wadaa, sirkaalow. 6 Oo markaasuu intuu kacay ayuu gurigii
galay, dabadeedna saliiddii buu madaxiisa ku shubay, oo
wuxuu ku yidhi, Rabbiga ah Ilaaha reer binu Israa'iil wuxuu
kugu leeyahay, Waxaan kuu subkay inaad ahaato boqor
u taliya dadka Ilaah oo ah dadka Israa'iil. 7 Oo adna waa
inaad laysaa reerka Axaab ee sayidkaaga, inaan ka aargudo
dhiiggii addoommadaydii nebiyada ahaa, iyo addoommadii
Rabbiga oo dhan ee ay Yesebeel daadisay. 8 Waayo, Axaab
reerkiisa oo dhammu waa halligmayaa; oo Axaab waan ka
baabbi'in doonaa wiil kasta ha ahaado mid kasta oo dalka
Israa'iil ku dhex xidhan ama mid kasta oo ku dhex furan. 9 Oo
reerka Axaab waxaan ka dhigayaa sidii reerkii Yaaraabcaam
ina Nebaad iyo sidii reerkii Bacshaa ina Axiiyaah oo kale. 10
Oo Yesebeel ayaa eeydu ku cuni doonaan dhulka Yesreceel,
oo ninna iyada ma xabaali doono, oo markaasuu albaabkii
furay oo cararay. 11 Markaasaa Yeehuu u soo baxay
addoommadii sayidkiisii; oo midkood baa wuxuu isagii
ku yidhi, War wax waluba ma hagaagsan yihiin? Ninkan
waalanu muxuu kuugu yimid? Oo isna wuxuu ku yidhi, Idinku
waad garanaysaan ninka iyo hadalkiisu wuxuu ahaaba. 12
Oo iyana waxay yidhaahdeen, Taasu waa been; ee bal
hadda noo sheeg. Markaasuu yidhi, Saas iyo saas buu igula
hadlay, oo igu yidhi, Rabbigu wuxuu kugu leeyahay, Waxaan
kuu subkay inaad ahaato boqor u taliya dalka Israa'iil.
13 Markaasay dhaqsadeen oo nin waliba wuxuu qaatay
dharkiisii, oo hoostiisay dhigeen jaranjarada dusheeda, buun
bayna ku dhufteen, oo waxay yidhaahdeen, Yeehuu waa
boqor. 14 Sidaasuu Yeehuu ina Yehooshaafaad oo ahaa
ina Nimshii u shirqoolay Yooraam. (Haddaba Yooraam iyo
dadka Israa'iil oo dhammu waxay u sii haysteen Raamod
Gilecaad Xasaa'eel oo ahaa boqorkii Suuriya daraaddiis, 15
laakiinse Boqor Yooraam wuxuu ku noqday Yesreceel in laga
soo daweeyo nabrihii reer Suuriya ku dhufteen markuu la

diriray boqorkii reer Suuriya oo Xasaa'eel ahaa). Markaasaa
Yeehuu wuxuu yidhi, Hadday idinla wanaagsan tahay yaan
ninna baxsan oo magaalada ka bixin si uu intuu Yesreceel
tago xaalkan u sheego. 16 Markaasuu Yeehuu gaadhifaras
fuulay, oo wuxuu tegey xagga Yesreceel, waayo, Yooraam
baa halkaas jiifay, oo Axasyaah oo ahaa boqorkii dalka
Yahuudahna wuxuu u yimid inuu Yooraam arko. 17 Haddaba
waardiyihii wuxuu kor taagnaa noobiyaddii Yesreceel, oo
wuxuu arkay kooxdii Yeehuu oo soo socota; markaasuu
yidhi, Waxaan u jeedaa koox. Yooraamna wuxuu yidhi, Nin
faras wata u dir, oo ha ka hor tago, oo ha ku yidhaahdo, War
ma nabad baa? 18 Sidaas daraaddeed waxaa tegey mid
faras ku jooga inuu isaga ka hor tago, oo wuxuu ku yidhi,
Boqorkii wuxuu ku leeyahay, Ma nabad baa? Oo Yeehuu
baa wuxuu ku yidhi, War maxaa nabad kaa galay? I soo
daba gal. Markaasaa ninkii waardiyaha ahaa wuxuu yidhi,
Ninkii wargeeyska ahaa wuu u tegey iyagii, laakiinse soo
noqon maayo. 19 Markaasuu haddana diray mid labaad
oo faras ku jooga, oo isna intuu u tegey ayuu ku yidhi,
Boqorkii wuxuu ku leeyahay, Ma nabad baa? Oo Yeehuu
baa ugu jawaabay, War maxaa nabad kaa galay? I soo daba
gal. 20 Markaasaa ninkii waardiyaha ahaa yidhi, Isna wuu
u tegey iyagii, laakiinse soo noqon maayo, oo socodkuna
wuxuu u eg yahay sidii socodkii Yeehuu ina Nimshii; waayo,
wuxuu gaadhifaraskiisa u kaxeeyaa sidii isagoo waalan.
21 Markaasaa Yooraam yidhi, Gaadhifaras diyaariya. Oo
iyana gaadhifaraskiisii ayay diyaariyeen. Kolkaasaa Yooraam
oo ahaa boqorkii dalka Israa'iil iyo Axasyaah oo ahaa
boqorkii dalka Yahuudahba waxay baxeen isagoo mid waliba
gaadhifaraskiisii ku jiro, oo waxay u baxeen inay Yeehuu
ka hor tagaan, oo waxay ka heleen beertii Naabood kii
reer Yesreceel. 22 Oo markii Yooraam Yeehuu arkay ayuu
ku yidhi, War Yeehuu, ma nabad baa? Oo isna wuxuu
ugu jawaabay, War xaggee nabadu joogtaa inta hooyadaa
Yesebeel dhillanimadeedii iyo sixirnimadeediiba ay aad u
badan yihiin? 23 Markaasaa Yooraam intuu faraskii dib
u ceshaday ayuu cararay oo wuxuu Axasyaah ku yidhi,
War Axasyaah, tanu waa khiyaano. 24 Markaasaa Yeehuu
qaansadiisii ku xooday xooggiisii oo dhan, oo Yooraam ku
dhuftay labada garab dhexdooda, oo fallaadhiina waxay
ka mudhbaxday wadnaha, markaasuu ku dhex dhacay
gaadhifaraskiisii. 25 Kolkaasaa Yeehuu wuxuu ku yidhi
Bidqar oo sirkaalkiisii ahaa, Isaga kor u qaad oo ku dhex
tuur beerta Naabood kii reer Yesreceel; waayo, bal xusuuso
sidii Rabbigu isaga hadalkan culus uga sheegay markaynu
aniga iyo adiguba innagoo fardo fuushan aabbihiis Axaab
daba soconnay; 26 Rabbigu wuxuu yidhi, Hubaal shalayto
waxaan arkay Naabood dhiiggiisii iyo dhiiggii wiilashiisii,
haddaba adiga beertan baan abaalkaaga kugu siinayaa.
Sidaas daraaddeed isaga qaad oo beerta ku dhex tuur sidii
erayga Rabbigu ahaa. 27 Laakiinse Axasyaah oo ahaa
boqorkii dalka Yahuudah markuu taas arkay ayuu u cararay
xagga gurigii beerta. Oo Yeehuuna wuu eryaday oo wuxuu
yidhi, War isagana gaadhifaraskiisa ku dhex dila. Markaasay
isagii ku dileen jiirtii Guur oo Yiblecaam ku ag taal. Wuuna
u cararay xagga Megiddoo oo halkaasuu ku dhintay. 28
Addoommadiisii ayaa gaadhifaras xagga Yeruusaalem ugu
qaaday, oo qabrigiisii ayay awowayaashiis kula aaseen
magaaladii Daa'uud dhexdeeda. 29 Oo Axasyaah wuxuu
dalka Yahuudah boqor ka noqday sannaddii kow iyo
tobnaad oo Yooraam ina Axaab. 30 Oo Yeehuu markuu
Yesreceel yimid ayaa Yesebeel maqashay, markaasay intay
indhakuulatay oo gambaysatay daaqaddii ka fiirisay. 31
Oo markii Yeehuu iriddii ka soo galay ayay tidhi, Simriigii
sayidkiisii dilayow, ma nabad baa? 32 Oo isna intuu kor u
eegay xagga daaqaddii ayuu yidhi, War yaa ila gees ah?
Yaa ila gees ah? Markaasaa waxaa soo fiiriyey laba ama
saddex nin oo bohon ah. 33 Kolkaasuu ku yidhi, Soo tuura
iyada. Iyana way soo tuureen, oo dhiiggeedii waxaa qaar
ku saydhmay derbigii iyo fardihii; oo isna kolkaasuu iyadii
ku tuntay. 34 Oo markuu meeshii galay ayuu wax cunay
oo wax cabbay, dabadeedna wuxuu yidhi, Bal naagtan
habaaran u jeesta oo aasa, waayo, iyadu waa ina boqor. 35
Oo iyana waxay u tageen inay iyadii soo aasaan, laakiinse
waxba kama ay helin dhaladii iyo cagihii iyo calaacalihii
gacmaheeda mooyaane. 36 Sidaas daraaddeed way soo
noqdeen, oo isagii bay u soo sheegeen. Wuxuuna yidhi,
Kanu waa eraygii Rabbigu kaga hadlay addoonkiisii Eliiyaah
kii reer Tishbii isagoo leh, Beerta Yesreceel dhexdeeda
ayaa eeydu ku cuni doonaan Yesebeel hilibkeeda. 37 Oo
Yesebeel meydkeedu wuxuu ahaan doonaa sida digo taal
beerta Yesreceel dhexdeeda, si aan loo odhan, Tanu waa
Yesebeel.

**10** Haddaba Axaab wuxuu Samaariya ku lahaa
toddobaatan wiil. Yeehuuna warqaduu qoray oo wuxuu
u diray Samaariya iyo taliyayaashii Yesreceel oo ahaa
odayaashii, iyo kuwii soo koriyey wiilashii Axaab, oo wuxuu
ku yidhi, 2 Waxaa idinla jooga wiilashii sayidkiinna, oo
waxaad haysataan gaadhifardood iyo fardo, oo weliba
waxaad ku jirtaan magaalo deyr leh, hubna waad haysataan;
haddaba markii warqaddanu idiin timaado, 3 doorta kan
ugu wanaagsan oo ugu wada fiican wiilasha sayidkiinna
oo ku fadhiisiya carshigii aabbihiis, oo u dirira sayidkiinna

aawadiis. 4 Laakiinse aad iyo aad bay u baqeen, oo waxay
yidhaahdeen, Labadii boqorba way hor joogsan waayeene
bal innagu sidee baynu u taagnaanaynaa? 5 Oo kii reerka
u sarreeyey, iyo kii magaalada u sarreeyey, iyo weliba
odayaashii, iyo kuwii carruurta soo koriyeyba Yeehuu bay u
cid direen, oo ku yidhaahdeen, Annagu addoommadaadii
baannu nahay, oo wax alla wixii aad nagu amartana waannu
yeelaynaa; oo annagu ninnaba boqor ka dhigan mayno;
haddaba wax alla wixii kula wanaagsan samee. 6 Oo isna
mar labaad buu warqad u qoray isagoo leh, Haddaad ila
jirtaan, oo aad codkayga maqlaysaan, berrito hadda oo kale
wiilasha sayidkiinna madaxyadooda Yesreceel iigu keena.
Haddaba boqorka wiilashiisii oo toddobaatan qof ahaa waxay
la joogeen raggii magaalada ugu waaweynaa oo iyaga
soo koriyey. 7 Oo markii warqaddii u timid ayay wiilashii
boqorka soo kaxeeyeen oo laayeen iyagoo toddobaatan qof
ah, oo madaxyadoodii ayay dambiilo ku gureen, oo isagii
bay Yesreceel ugu direen. 8 Oo waxaa isagii u yimid mid
wargeeys ah, oo intuu u warramay ayuu ku yidhi, Wiilashii
boqorka madaxyadoodii waa la keenay. Oo isna wuxuu
ku yidhi, Iridda laga soo galo albaabka laba tuulmo u kala
dhiga, oo ilaa berri subax ha yaalleen. 9 Oo markii subaxdii
la gaadhay ayuu soo baxay oo dibadda istaagay, oo wuxuu
dadkii oo dhan ku yidhi, Idinku xaq baad tihiin! Bal eega,
anigu sayidkaygii baan shirqoolay, oo waan dilay, laakiinse
bal yaa kuwan oo dhan laayay? 10 Haddaba bal ogaada in
Eraygii Rabbiga ee uu Rabbigu reer Axaab kaga hadlay
aan waxba dhulka kaga dhacayn, maxaa yeelay, Rabbigu
waa sameeyey wixii uu kaga hadlay addoonkiisii Eliiyaah.
11 Sidaasuu Yeehuu Yesreceel ugu laayay reerkii Axaab
intii ka hadhay oo dhan, iyo raggiisii waaweynaa oo dhan,
iyo saaxiibbadiisii oo dhan, iyo wadaaddadiisii, ilaa uusan
waxba u reebin. 12 Markaasuu kacay oo baxay, oo wuxuu
tegey Samaariya. Oo markuu gaadhay gurigii adhijirrada
ee jidka ku yiil 13 ayaa Yeehuu la kulmay boqorkii dalka
Yahuudah oo Axasyaah ahaa walaalihiis, oo wuxuu ku yidhi,
War yaad tihiin? Oo iyana waxay ugu jawaabeen, Annagu
waxaannu nahay Axasyaah walaalihiis, oo waxaannu u
soconnaa inaannu soo salaanno carruurtii boqorka iyo
carruurtii boqoradda. 14 Oo isna wuxuu yidhi, iyagoo nool
nool qabqabta. Markaasaa la qabtay iyagoo nool nool, oo
waxaa iyagoo ah laba iyo afartan nin lagu ag laayay godkii
guriga adhijirrada, oo midkoodna kama uu tegin. 15 Oo
markuu halkaas ka tegey ayuu la kulmay Yehoonaadaab ina
Reekaab oo soo socda inuu ka hor tago, oo intuu salaamay
ayuu ku yidhi, War sidaan kuugu qalbi fayoobahay oo kale
ma iigu qalbi fayow dahay? Markaasaa Yehoonaadaab
ugu jawaabay, Haah, oo waan kuu qalbi fayoobahay. Isna
wuxuu yidhi, Hadday saas tahay gacanta ii dhiib. Markaasuu
gacanta u dhiibay, oo isna gaadhifaraskiisii ayuu soo saartay.
16 Markaasuu ku yidhi, Kaalay, i raac, oo fiiri qiirada aan
Rabbiga u qabo. Sidaasaa loo fuushiyey gaadhifaraskiisii.
17 Oo haddana markuu Samaariya gaadhay ayuu wada
laayay intii Axaab Samaariya ugu hadhay oo dhan ilaa uu
u baabbi'iyey sidii uu ahaa eraygii Rabbigu kula hadlay
Eliiyaah. 18 Markaasaa Yeehuu soo wada ururiyey dadkii oo
dhan, oo wuxuu ku yidhi, Axaab in yar buu Bacal u adeegi
jiray, laakiinse anoo Yeehuu ah si weyn baan ugu adeegi
doonaa. 19 Haddaba sidaas daraaddeed iigu soo wada
yeedha nebiyadii Bacal oo dhan, iyo intii isaga caabudi jirtay
oo dhan, iyo wadaaddadiisii oo dhan; oo midna yuusan ka
maqnaan, waayo, allabari weyn baan Bacal u bixinayaa; oo
ku alla ka maqnaadaa noolaan maayo. Laakiinse Yeehuu
saas khiyaanuu u sameeyey, waayo, wuxuu damacsanaa
inuu wada baabbi'iyo inta Bacal caabudda oo dhan. 20
Yeehuuna wuxuu yidhi, Shir weyn Bacal quduus uga dhiga.
Oo taas waa la naadiyey. 21 Oo Yeehuuna wuxuu u cid
diray dalka Israa'iil oo dhan, markaasaa waxaa yimid intii
Bacal caabudi jirtay oo dhan, sidaas daraaddeed nin aan
iman ma jirin. Oo waxay soo galeen gurigii Bacal; oo gurigii
Bacalna waa buuxsamay gees ilaa gees. 22 Markaasuu
wuxuu ku yidhi kii meeshii dharka u sarreeyey, Inta Bacal
caabudda oo dhan dhar u keen. Kolkaasuu dhar u keenay.
23 Markaasaa Yeehuu iyo Yehoonaadaab ina Reekaab
waxay galeen gurigii Bacal, Yeehuuna wuxuu ku yidhi kuwii
Bacal caabudayay, Baadha oo iska fiiriya inaan halkan
addoommadii Rabbiga waxba idinkala joogin, laakiinse aad
tihiin kuwa Bacal caabuda oo keliya. 24 Markaasay gudaha
u galeen inay allabaryo iyo qurbaanno la gubo bixiyaan.
Haddaba Yeehuu wuxuu mar hore soo doortay siddeetan
nin inay dibadda joogaan, oo wuxuu ku yidhi, Nimanka
aan gacantiinna soo geliyo hadduu midna baxsado, kii
sii daaya ayaa naftiisa loo qisaasayaa. 25 Oo haddiiba
markuu dhammeeyey allabarigii gubnaa oo uu bixinayay
ayaa Yeehuu ku yidhi askartii iyo saraakiishii, Gala oo wada
laaya, oo yaan midna ka soo bixin. Markaasay seef ku
laayeen, oo askartii ordi jirtay iyo saraakiishii ayaa iyagii
dibadda u soo tuuray oo waxay tageen magaaladii guriga
Bacal. 26 Oo waxay soo bixiyeen tiirarkii guriga Bacal ku jiray,
wayna gubeen. 27 Wayna jebiyeen tiirkii Bacal, oo dumiyeen
gurigii Bacal oo ilaa maantadan waxay ka dhigeen meel lagu
saxaroodo. 28 Oo Yeehuu sidaasuu Bacal uga baabbi'iyey
dalka Israa'iil. 29 Habase yeeshee dembiyadii Yaaraabcaam
ina Nebaad kii dadka Israa'iil dembaajiyey Yeehuu kama

hadhin, kuwaasoo ahaa weylihii dahabka ahaa ee dhex yiil
Beytel iyo Daan. 30 Markaasaa Rabbigu wuxuu Yeehuu
ku yidhi, Si wanaagsan baad u yeeshay wax hortayda ku
toosan, oo reerkii Axaabna waad ku samaysay wax alla wixii
qalbigayga ku jiray oo dhan, haddaba sidaas daraaddeed
farcankaaga qarniga afraad ah ayaa ku fadhiisan doona
carshiga dalka Israa'iil. 31 Laakiinse Yeehuu iskama uu
jirin oo kuma socon sharcigii Rabbiga ah Ilaaha reer binu
Israa'iil, kumana raacin qalbigiisa oo dhan, oo kama tegin
dembiyadii Yaaraabcaam uu dadka Israa'iil dembaajiyey.
32 Oo waagaas ayaa Rabbigu bilaabay inuu dalka Israa'iil
yareeyo, oo Xasaa'eel ayaa iyaga ku laayay dalka Israa'iil
oo dhan, 33 oo laga bilaaba Webi Urdun ilaa barigiisa,
intaas oo ah dalka Gilecaad oo dhan, iyo reer Gaad, iyo
reer Ruubeen, iyo reer Manaseh, iyo tan iyo Carooceerta
ku ag taal Webi Arnoon, iyo xataa Gilecaad iyo Baashaan.
34 Haddaba Yeehuu falimihiisii kale iyo wixii uu sameeyey
oo dhan, iyo xooggiisii oo dhammuba sow kuma qorna
kitaabkii taariikhda boqorradii dalka Israa'iil? 35 Markaasaa
Yeehuu dhintay oo la seexday awowayaashiis, oo waxaa
lagu aasay Samaariya. Oo meeshiisiina waxaa boqor ka
noqday wiilkiisii Yehoo'aaxaas. 36 Oo wakhtigii Yeehuu dalka
Israa'iil Samaariya boqorka ugu ahaa wuxuu ahaa siddeed
iyo labaatan sannadood.

**11** Catalyaah oo ahayd Axasyaah hooyadiis markay
aragtay in wiilkeedii dhintay ayay kacday oo wada
baabbi'isay farcankii reer boqor oo dhan. 2 Laakiinse
Yehooshebac oo ahayd Boqor Yooraam gabadhiisii, oo
Axasyaahna walaashiis ahayd, waxay la tagtay Axasyaah
wiilkiisii Yoo'aash, oo ay ka dhex xadday wiilashii boqorka ee
la laayay, isagii iyo tii xannaanayn jirtayba, oo waxay gelisay
qolka la seexdo, oo iyana Catalyaah way ka qariyeen,
sidaas daraaddeed isagii lama dilin. 3 Oo isna iyadii buu la
joogay, oo wuxuu kula qarsoonaa gurigii Rabbiga intii lix
sannadood ah; oo dalkiina waxaa u talisay Catalyaah. 4
Oo sannaddii toddobaad ayaa Yehooyaadaac u cid diray
oo isugu yeedhay boqol u taliyayaashii u taliyey reer Kaarii
iyo askartii ordi jirtay, oo gurigii Rabbiga ayuu keensaday;
markaasuu axdi la dhigtay oo iyagii gurigii Rabbiga gudihiisa
ku dhaariyey, dabadeedna wuxuu tusay wiilkii boqorka. 5
Wuuna amray oo ku yidhi, Idinku sidan yeela: meeshiinna
saddexaad ee sabtida gashaa waa inay guriga boqorka
ilaaliyaan; 6 oo meel saddexaadna iridda Suur ha joogeen;
meel saddexaadna ha joogeen iridda askartii ordi jirtay ka
dambaysa; sidaas waa inaad guriga u ilaalisaan oo aad wax
uga celisaan. 7 Oo labadiinna guuto oo ah kulli inta sabtida
baxda oo dhanba waa inay guriga Rabbiga ilaaliyaan iyagoo
boqorka ku wareegsan. 8 Oo idinku waxaad isku wareejisaan
boqorka idinkoo nin waluba hubkiisa gacanta ku haysto, oo
midkii safafka soo dhex gala ha la dilo, oo boqorkana la jira
markuu baxayo iyo markuu soo gelayoba. 9 Oo boqol u
taliyayaashiina way yeeleen wixii wadaadkii Yehooyaadaac
ahaa ku amray oo dhan; oo nin waluba wuxuu kaxeeyey
raggiisii sabtida geli lahaa iyo kuwii sabtida bixi lahaa, oo
waxay u yimaadeen wadaadkii Yehooyaadaac ahaa. 10
Markaasaa wadaadkii wuxuu boqol u taliyayaashii siiyey
warmihii iyo gaashaammadii Boqor Daa'uud lahaa oo guriga
Rabbiga yiil. 11 Markaasay askartii isagoo nin waluba hubkiisii
gacanta ku haysto istaageen guriga dhankiisii midig iyo ilaa
dhankiisii bidix iyo meeshii allabariga agteeda iyo guriga
agtiisa, oo boqorkii bayna isku wareejiyeen. 12 Markaasuu
wiilkii boqorka soo bixiyey, oo wuxuu madaxa u saaray
taajkii, markhaatifurkiina wuu siiyey; oo waxay ka dhigeen
boqor, wayna subkeen, kolkaasay u sacbiyeen, oo waxay
yidhaahdeen, Boqorku ha noolaado. 13 Oo Catalyaahna
markay qayladii askarta iyo dadka maqashay ayay dadkii ugu
timid gurigii Rabbiga. 14 Oo bal eeg, boqorku wuxuu taagnaa
tiirka agtiisa siday caadadu ahayd, oo saraakiishii iyo kuwii
turumbada watayna boqorkay ag taagnaayeen; oo dadkii
waddanka oo dhammuna way reyreeyeen oo turumbooyin
afuufeen. Markaasaa Catalyaah dharkeedii iska jeexjeexday
oo waxay ku qaylisay, Waa fallaagow, waa fallaagow! 15
Markaasaa wadaadkii Yehooyaadaac ahaa amray boqol
u taliyayaashii ciidanka u sarreeyey, oo wuxuu ku yidhi,
Iyada soo bixiya oo safafka soo dhex mariya, oo kii soo
raacana seef ku dila, waayo, wadaadku wuxuu yidhi, Iyada
yaan lagu dhex dilin guriga Rabbiga. 16 Sidaas daraaddeed
iyadii meel bay u banneeyeen, markaasay tagtay marinkii
ay farduhu gurigii boqorka u mari jireen, oo halkaasaa
lagu dilay. 17 Markaasaa Yehooyaadaac sameeyey axdi
u dhexeeya Rabbiga iyo boqorka iyo dadkaba inay iyagu
ahaadaan Rabbiga dadkiisa, oo haddana wuxuu dhex dhigay
boqorkii iyo dadkii. 18 Dabadeedna dadkii waddanka oo
dhammu waxay tageen gurigii Bacal, oo way dumiyeen,
oo meelihiisii allabariga iyo sanamyadiisii oo dhanna way
wada burburiyeen, oo Mataan oo ahaa Bacal wadaadkiisiina
waxay ku dileen meelihii allabariga hortooda. Oo wadaadkii
wuxuu doortay kuwa gurigii Rabbiga u taliya. 19 Oo haddana
wuxuu kaxeeyey boqol u taliyayaashii iyo kuwii reer Kaarii,
iyo askartii ordi jirtay, iyo dadkii waddanka oo dhanba, oo
waxay boqorkii ka soo dejiyeen gurigii Rabbiga, oo intay jidkii
iridda waardiyayaasha soo mariyeen ayay keeneen gurigii
boqorka. Oo isna wuxuu ku fadhiistay carshigii boqorrada.

20 Sidaas daraaddeed dadkii waddanka oo dhammu way
wada reyreeyeen, oo magaaladiina way xasilloonayd, oo
Catalyaahna gurigii boqorka agtiisa ayay seef ku dileen.
21 Oo Yehoo'aashna toddoba sannadood buu jiray markuu
boqor noqday.

12 Oo Yehoo'aash wuxuu boqor noqday sannaddii
toddobaad oo Yeehuu; oo afartan sannadood ayuu
Yeruusaalem boqor ku ahaa; oo hooyadiis magaceeduna
wuxuu ahaa Sibyaah tii reer Bi'ir Shebac. 2 Oo Yehoo'aashna
wuxuu sameeyey wixii Rabbiga hortiisa ku qummanaa
wakhtigii uu wadaadkii Yehooyaadaac isaga baray oo
dhan. 3 Habase yeeshee meelihii sarsare lama baabbi'in;
oo dadkuna meelihii sarsare weli way ku allabaryi jireen,
fooxna way ku shidi jireen. 4 Oo Yehoo'aash wuxuu
ku yidhi wadaaddadii, Alaabta quduuska laga dhigay ee
guriga Rabbiga la keenay lacagteeda oo dhan, taas oo
ah lacagta nin waluba bixiyey markuu u gudbay kuwa la
tiriyo, iyo lacagta kuwii lagu qiimeeyey, iyo lacagta nin
kastaba qalbigiisa ka damcay inuu guriga Rabbiga keeno,
5 wadaaddada nin waluba ha ka qaado kii uu yaqaan, oo
ha ku dhiso meelaha guriga ka jajaban meel kasta oo
meel jaban laga heloba. 6 Laakiinse sannaddii saddex iyo
labaatanaad oo Yehoo'aash wadaaddadii weli ma ay dhisin
guriga meelihiisii jajabnaa. 7 Markaasaa Boqor Yehoo'aash
wuxuu u yeedhay wadaadkii Yehooyaadaac ahaa, iyo
wadaaddadii kaleba, oo wuxuu ku yidhi, War maxaad guriga
meelihiisa jajaban u dhisi weydeen? Haddaba lacag dambe
ha ka qaadanina dadka aad taqaaniin, laakiinse meelaha
jajaban ee guriga aawadood ku bixiya. 8 Oo wadaaddadiina
waxay oggolaadeen inayan dadka lacag dambe ka qaadin,
oo guriga meelihiisa jajabanna ayan dhisin. 9 Laakiinse
wadaadkii Yehooyaadaac ahaa ayaa intuu sanduuq qaaday
daboolka ka dalooliyey oo wuxuu ag qotomiyey meeshii
allabariga xagga midigta markii guriga Rabbiga la soo
gelayo; oo wadaaddadii albaabka dhawri jiray ayaa ku riday
lacagtii guriga Rabbiga la keenay oo dhan. 10 Oo markay
arkeen in lacag badanu sanduuqii ku jirto ayaa waxaa yimid
karraanigii boqorka iyo wadaadkii sare, oo kiishash bay ku
gureen markay tiriyeen lacagtii laga helay gurigii Rabbiga.
11 Oo lacagtii la miisaamay ayay u dhiibeen kuwii shuqulka
sameeyey, kuwaas oo guriga Rabbiga u talin jiray; oo
waxay siiyeen nijaarradii iyo waxdhisayaashii ka shaqeeyey
gurigii Rabbiga, 12 iyo wastaadyadii, iyo kuwii dhagaxyada
qori jiray, waxayna u bixiyeen in lagu iibiyo alwaax iyo
dhagaxyo la qoray si loogu dhiso meelihii guriga Rabbiga
ka jajabnaa, iyo wax kasta oo loo bixiyey in guriga lagu
dhiso. 13 Laakiinse lacagtii guriga Rabbiga la soo geliyey
guriga Rabbiga looguma samayn koobab lacag ah, iyo alaab
laambado lagu safeeyo, iyo maddiibado, iyo turumbooyin,
iyo innaba weelal dahab ah amase weelal lacag ah, 14
waayo, waxay lacagtii siiyeen kuwii shuqulka sameeyey,
oo waxay ku dhiseen gurigii Rabbiga. 15 Oo weliba lama
ay xisaabtamin raggii ay lacagta u dhiibeen inay iyagu
siiyaan nimankii shuqulka sameeyey, maxaa yeelay, waxay
ku shaqeeyeen aaminnimo. 16 Oo lacagtii qurbaannada
xadgudubka iyo lacagtii qurbaannada dembiga toona lama
soo gelin gurigii Rabbiga; oo waxaa iska lahaa wadaaddada.
17 Markaasaa Xasaa'eel oo ahaa boqorkii Suuriya kacay oo
wuxuu la diriray Gad, wuuna qabsaday. Kolkaasaa Xasaa'eel
wuxuu u jeestay oo u kacay Yeruusaalem. 18 Markaasaa
Yehoo'aash oo ahaa boqorkii dalka Yahuudah wada qaaday
alaabtii quduuska ahayd oo dhan, taasoo ay boqorradii dalka
Yahuudah quduus ka dhigeen, iyagoo ahaa awowayaashiis
Yehooshaafaad, iyo Yehooraam, iyo Axasyaah, iyo weliba
isaga alaabtiisii quduuska ahayd, iyo kulli dahabkii laga
helay khasnadihii guriga Rabbiga iyo gurigii boqorkaba,
oo wuxuu u diray boqorkii Suuriya oo Xasaa'eel ahaa; oo
isna Yeruusaalem wuu ka tegey. 19 Haddaba Yoo'aash
falimihiisii kale iyo wixii uu sameeyey oo dhammu sow kuma
qorna kitaabkii taariikhda boqorradii dalka Yahuudah? 20 Oo
addoommadiisii intay ku kaceen ayay sirqooleen, oo waxay
Yoo'aash ku dileen guriga Millo agtiisa oo ku ag yiil jidka u
kaca xagga Sillaa. 21 Oo kuwii isagii dilay waxay ahaayeen
addoommadiisii oo ahaa Yooskar oo ay Shimcaad dhashay
iyo Yehoosaabaad oo ay Shomeer dhashay; wuuna dhintay,
oo waxaa awowayaashiis lagula aasay magaaladii Daa'uud;
oo meeshiisiina waxaa boqor ka noqday wiilkiisii Amasyaah.

13 Yoo'aash ina Axasyaah oo ahaa boqorkii dalka
Yahuudah sannaddiisii saddex iyo labaatanaad ayaa
Yehoo'aaxaas ina Yeehuu dalka Israa'iil boqor ugu noqday
Samaariya, oo wuxuuna boqor ahaa toddoba iyo toban
sannadood. 2 Oo wuxuu sameeyey wax Rabbiga hortiisa shar
ku ah, wuuna raacay dembiyadii Yaaraabcaam ina Nebaad
uu dadkii Israa'iil dembaajiyey, kamana uu tegin. 3 Oo
Rabbiga cadhadiisiina aad bay ugu kululaatay dadkii Israa'iil,
oo wuxuu had iyo goorba gacanta u gelin jiray Xasaa'eel
oo ahaa boqorkii Suuriya, iyo Benhadad ina Xasaa'eel. 4
Oo Yehoo'aaxaas ayaa Rabbiga baryay, Rabbiguna wuu
maqlay, waayo, wuxuu arkay dulmigii uu boqorkii Suuriya
dadka Israa'iil ku hayay. 5 (Markaasaa Rabbigu wuxuu dadkii
Israa'iil siiyey badbaadiye, wayna ka hoos baxeen gacantii
reer Suuriya; kolkaasay dadkii Israa'iil teendhooyinkoodii

iska degeen sidii hore. 6 Habase yeeshee kama ay
tegin dembiyadii reerkii Yaaraabcaam uu dadkii Israa'iil
dembaajiyey, laakiinse way ku socdeen, oo Samaariyana
waxaa ku hadhay geedihii Asheeraah.) 7 Waayo, Rabbigu
waxba dadkii ugama uu reebin Yehoo'aaxaas konton nin oo
fardooley ah, iyo toban gaadhifaras, iyo toban kun oo nin
oo lug ah mooyaane; waayo, boqorkii Suuriya wuu wada
baabbi'iyey, oo wuxuu ka dhigay sida boodhka lagu tunto
oo kale. 8 Haddaba Yehoo'aaxaas falimihiisii kale iyo wixii
uu sameeyey oo dhan, iyo xooggiisiiba sow kuma qorna
kitaabkii taariikhda boqorradii dalka Israa'iil? 9 Markaasaa
Yehoo'aaxaas dhintay oo la seexday awowayaashiis, oo
waxaa lagu aasay Samaariya; oo meeshiisiina waxaa boqor
ka noqday wiilkiisii Yoo'aash. 10 Yoo'aash oo ahaa boqorkii
dalka Yahuudah sannaddiisii toddoba iyo soddonaad ayaa
Yehoo'aash ina Yehoo'aaxaas dalka Israa'iil Samaariya boqor
ugu noqday, wuxuuna boqor ahaa lix iyo toban sannadood.
11 Oo isna wuxuu sameeyey wax Rabbiga hortiisa shar ku ah,
kamana uu tegin dembiyadii Yaaraabcaam ina Nebaad oo
dhan kuwaasoo uu dadkii Israa'iil dembaajiyey; laakiinse wuu
ku socday. 12 Haddaba Yoo'aash falimihiisii kale, iyo wixii uu
sameeyey oo dhan, iyo xooggiisii uu kula diriray Amasyaah
oo ahaa boqorkii dalka Yahuudah sow kuma qorna kitaabkii
taariikhda boqorradii dalka Israa'iil? 13 Markaasaa Yoo'aash
dhintay oo la seexday awowayaashiis, oo carshigiisiina
waxaa ku fadhiistay Yaaraabcaam; Yoo'aashna waxaa
Samaariya lagula aasay boqorradii dalka Israa'iil. 14 Haddaba
Eliishaa wuxuu la bukooday cudurkii uu u dhintay, oo waxaa
isagii u yimid Yoo'aash oo ahaa boqorkii dalka Israa'iil, oo
intuu ku dul ooyay ayuu ku yidhi, Aabbow, aabbow, bal eeg,
gaadhifardoodkii dalka Israa'iil iyo raggoodii fardooleyda
ahaa! 15 Markaasaa Eliishaa ku yidhi, Bal qaado qaanso iyo
fallaadho, kolkaasuu qaanso iyo fallaadho soo qaatay. 16 Oo
isna wuxuu boqorkii dalka Israa'iil ku yidhi, Bal qaansada
gacanta kor saar, markaasuu gacantii kor saaray. Kolkaasaa
Eliishaa gacmihiisii kor saaray gacmihii boqorka. 17 Oo
wuxuu ku yidhi, Bal daaqadda xagga bari fur; oo isna wuu
furay. Kolkaasaa Eliishaa ku yidhi, Fallaadha gan, oo isna
wuu ganay. Oo wuxuu yidhi, Tanu waa fallaadhii Rabbiga ee
badbaadada, oo waxa weeye fallaadha badbaadada laga heli
doona reer Suuriya; waayo, waa inaad reer Suuriya Afeeq
ku laysaa ilaa aad wada baabbi'iso. 18 Markaasuu yidhi, War
fallaadhaha qaado, oo isna wuu qaatay. Markaasuu boqorkii
dalka Israa'iil ku yidhi, Bal dhulka ku dhufo; kolkaasuu
saddex jeer dhulka ku dhuftay, oo joogsaday. 19 Markaasaa
ninkii Ilaah dhirfay oo wuxuu ku yidhi, War waxaa ku ekayd
inaad ku dhufatid shan ama lix jeer; oo markaas reer Suuriya
waad wada layn lahayd ilaa aad wada baabbi'iso; laakiinse
haatan reer Suuriya waxaad laynaysaa saddex jeer oo
keliya. 20 Markaasaa Eliishaa dhintay, waana la aasay. Oo
sannad kasta bilowgeeda waxaa dalka dhici jiray guutooyinkii
reer Moo'aab. 21 Markii nin la aasayay ayay kuwii aasayay u
jeedeen guuto soo socota; markaasay waxay ninkii ku dhex
tuureen qabrigii Eliishaa; oo haddiiba ninkii markuu taabtay
Eliishaa lafihiisii ayuu soo noolaaday, oo sara joogsaday. 22
Oo Xasaa'eel oo ahaa boqorkii Suuriya ayaa dadkii Israa'iil
dulmi jiray wakhtigii Yehoo'aaxaas oo dhan. 23 Laakiinse
Rabbigu iyaga wuu u roonaaday, oo u naxariistay, wuxuuna
ugu jeestay iyaga axdigii uu la dhigtay Ibraahim, iyo Isxaaq,
iyo Yacquub aawadiis, oo mana uu doonayn inuu baabbi'iyo
oo weli hortiisa kama uu tuurin. 24 Markaasaa Xasaa'eel oo
ahaa boqorkii Suuriya dhintay, oo meeshiisiina waxaa boqor
ka noqday wiilkiisii Benhadad. 25 Markaasaa Yehoo'aash ina
Yehoo'aaxaas ayaa Benhadad ina Xasaa'eel mar kale ka
qaatay magaalooyinkii uu dagaalka kaga qaatay aabbihiis
Yehoo'aaxaas. Oo Yoo'aash saddex jeer buu isagii dagaal ku
dhuftay oo ka soo dhacsaday magaalooyinkii dalka Israa'iil.

## 14

Yoo'aash ina Yoo'aaxaas ee ahaa boqorkii dalka Israa'iil
sannaddiisii labaad ayaa Amasyaah ina Yoo'aash dalka
Yahuudah boqor ka noqday. 2 Oo markuu boqor noqday
wuxuu jiray shan iyo labaatan sannadood, oo Yeruusaalem
ayuu boqor ku ahaa sagaal iyo labaatan sannadood, oo
hooyadiisna magaceeda waxaa la odhan jiray Yehoocaddiin
tii reer Yeruusaalem. 3 Oo wuxuu sameeyey wax Rabbiga
hortiisa ku qumman, laakiinse ma uu samayn sidii awowgiis
Daa'uud sameeyey oo kale; wuxuuse sameeyey kulli wixii
aabbihiis Yoo'aash sameeyey oo kale. 4 Habase yeeshee
meelihii sarsare lama baabbi'in; oo dadku weli way ku
allabaryi jireen, fooxna way ku shidi jireen meelihii sarsare. 5
Oo haddiiba markii boqortooyadiisii xoogaysatay ayuu laayay
addoommadiisii dilay boqorkii aabbihiis ahaa. 6 Laakiinse
gacankudhiiglayaasha carruurtoodii ma uu dilin; oo wuxuu
yeelay sida ku qoran kitaabkii sharcigii Muuse sidii Rabbigu
amray, isagoo leh, Aabbayaasha yaan loo dilin carruurtooda,
carruurtana yaan loo dilin aabbayaashood; laakiinse nin
waluba dembigiisa ha u dhinto. 7 Oo Dooxadii Cusbada
wuxuu reer Edom kaga laayay toban kun oo nin, oo Selacna
dagaal buu ku qabsaday, oo wuxuu magaceedii u bixiyey
Yoqte'eel, ilaa maantadanna waa loo yaqaan. 8 Markaasaa
Amasyaah wargeeyayaal u diray Yehoo'aash oo ahaa ina
Yehoo'aaxaas ina Yeehuu oo ahaa boqorkii dalka Israa'iil, oo
wuxuu ku yidhi, Car kaalay aynu iska hor nimaadnee. 9
Kolkaasaa Yehoo'aash oo ahaa boqorkii dalka Israa'iil u cid

diray Amasyaah oo ahaa boqorkii dalka Yahuudah, oo wuxuu
ku yidhi, Yamaaruggii Lubnaan ku yiil wuxuu u cid diray
geedkii kedarka ah oo Lubnaan ku yiil, oo wuxuu ku yidhi,
Gabadhaada sii wiilkaygu ha guursadee; oo waxaa halkaas
soo maray bahal Lubnaan joogay, markaasuu yamaaruggii
ku joogsaday. 10 Hubaal reer Edom baad laysay, waanad isla
weynaatay, haddaba faan oo dalkaaga iska joog, waayo, bal
maxaad belaayo isugu soo jiidaysaa oo aad adiga iyo dadka
Yahuudahba u wada dhacaysaan? 11 Laakiinse Amasyaah
taas wuu maqli waayay. Markaasuu Yehoo'aash oo ahaa
boqorkii dalka Israa'iil soo kacay, oo isagii iyo Amasyaah oo
ahaa boqorkii dalka Yahuudah waxay iskaga hor yimaadeen
Beytshemesh oo uu dadka Yahuudah leeyahay. 12 Oo
dadka Israa'iil way ka adkaadeen dadka Yahuudah, oo nin
waluba wuxuu u cararay teendhadiisii. 13 Oo Yehoo'aash
oo ahaa boqorkii dalka Israa'iil ayaa Amasyaah oo ahaa
boqorkii dalka Yahuudah kaasoo ahaa ina Yehoo'aash oo
ahaa ina Axasyaah, ku qabtay Beytshemesh, oo intuu
Yeruusaalem yimid ayuu dumiyey derbigii Yeruusaalem tan
iyo iriddii Efrayim iyo ilaa iriddii geeska ahayd, intaasoo
ahayd afar boqol oo dhudhun. 14 Oo wuxuu qaatay dahabkii
iyo lacagtii oo dhan iyo weelashii laga helay guriga Rabbiga
iyo khasnadihii guriga boqorka oo dhan, oo dadna cudhaadh
ahaan buu u kaxaystay, markaasuu Samaariya ku noqday.
15 Haddaba Yehoo'aash falimihiisii kale ee uu sameeyey, iyo
xooggiisii, iyo siduu ula diriray Amasyaah oo ahaa boqorkii
dalka Yahuudahba sow kuma qorna kitaabkii taariikhda
boqorradii dalka Israa'iil? 16 Markaasaa Yehoo'aash dhintay
oo la seexday awowayaashiis, oo Samaariya ayaa lagula
aasay boqorradii dalka Israa'iil, oo meeshiisiina waxaa
boqor ka noqday wiilkiisii Yaaraabcaam. 17 Oo Amasyaah
ina Yoo'aash oo ahaa boqorkii dalka Yahuudah shan iyo
toban sannadood buu sii noolaa markii Yehoo'aash ina
Yehoo'aaxaas oo ahaa boqorkii dalka Israa'iil uu dhintay
dabadeed. 18 Haddaba Amasyaah falimihiisii kale sow
kuma qorna kitaabkii taariikhda boqorradii dalka Yahuudah?
19 Oo isagii shirqool bay Yeruusaalem ugu sameeyeen,
markaasuu Laakiish u cararay, laakiinse Laakiish bay cid
uga daba direen, oo halkaasay ku dileen. 20 Markaasay
isagii fardo ku keeneen, oo awowayaashiis ayaa lagula
aasay Yeruusaalem oo ah magaaladii Daa'uud. 21 Oo dadkii
Yahuudah oo dhammu waxay soo kaxaysteen Casaryaah oo
lix iyo toban sannadood jiray, oo isagay boqor uga dhigeen
meeshii aabbihiis Amasyaah. 22 Oo isna Eelad wuu dhisay
oo dalka Yahuudah u soo celiyey markii boqorkii dhintay
oo la seexday awowayaashiis dabadeed. 23 Amasyaah ina
Yoo'aash oo ahaa boqorkii dalka Yahuudah sannaddiisii shan
iyo tobnaad ayaa Yaaraabcaam ina Yoo'aash dalka Israa'iil
Samaariya boqor ugu noqday, wuxuuna boqor ahaa kow
iyo afartan sannadood. 24 Oo isna wuxuu sameeyey wax
Rabbiga hortiisa shar ku ah, kamana uu tegin dembiyadii uu
Yaaraabcaam ina Nebaad dadkii Israa'iil dembaajiyey oo
dhan. 25 Oo wuxuu soo celiyey soohdintii dalka Israa'iil tan
iyo meesha laga galo Xamaad iyo tan iyo badda Caraabaah,
taasuna waa siduu ahaa Eraygii Rabbiga ah Ilaaha dadka
Israa'iil ee uu kaga hadlay addoonkiisii ahaa Nebi Yoonis
ina Amitay oo ahaa reer Gad Heefer. 26 Waayo, Rabbigu
wuxuu arkay dhibaatadii ay dadkii Israa'iil ku jireen inay
aad u qadhaadhayd, waayo, ma jirin mid xidhan iyo mid
furan toona, mana jirin mid dadkii Israa'iil u kaalmeeya. 27
Rabbigu ma uu odhan, Magaca dadka Israa'iil waan ka
baabbi'inayaa samada hoosteeda. Laakiinse iyagii wuxuu
ku badbaadiyey Yaaraabcaam ina Yoo'aash. 28 Haddaba
Yaaraabcaam falimihiisii kale, iyo wixii uu sameeyey oo
dhan, iyo xooggiisii, iyo siduu u dagaallamay, iyo siduu dalka
Israa'iil ugu soo celiyey Dimishaq iyo Xamaad oo ay dadkii
Yahuudah lahaayeen sow kuma qorna kitaabkii taariikhda
boqorradii dalka Israa'iil? 29 Markaasaa Yaaraabcaam
dhintay oo la seexday awowayaashiis kuwaasoo ahaa
boqorradii dalka Israa'iil, oo waxaa meeshiisii boqor ka
noqday wiilkiisii Sekaryaah.

**15** Yaaraabcaam oo ahaa boqorkii dalka Israa'iil
sannaddiisii toddoba iyo labaatanaad ayaa Casaryaah
ina Amasyaah dalka Yahuudah boqor ka noqday. 2 Oo
markuu boqor noqday wuxuu jiray lix iyo toban sannadood,
oo wuxuu Yeruusaalem boqor ku ahaa laba iyo konton
sannadood, oo hooyadiisna magaceeda waxaa la odhan
jiray Yekaalyaah tii reer Yeruusaalem. 3 Oo isna wuxuu
sameeyey wax Rabbiga hortiisa ku qumman, oo wuxuu wada
yeelay sidii aabbihiis Amasyaah yeelay oo kale. 4 Habase
yeeshee meelihii sarsare lama baabbi'in; oo dadkuna weli
way ku allabaryi jireen, fooxna way ku shidi jireen meelihii
sarsare. 5 Oo boqorkiina Rabbigaa wax ku dhuftay, haddaba
tan iyo maalintii uu dhintay wuxuu ahaa barasle, oo guri gaar
ah buu degay. Oo Yootam oo ahaa ina boqor ayaa reerka u
talin jiray, isagoo dadkii dalka degganaa u gar qaybinaya. 6
Haddaba Casaryaah falimihiisii kale iyo wixii uu sameeyey
oo dhammu sow kuma qorna kitaabkii taariikhda boqorradii
dalka Yahuudah? 7 Markaasaa Casaryaah dhintay oo la
seexday awowayaashiis; oo waxaa awowayaashiis lagula
aasay magaaladii Daa'uud, oo meeshiisiina waxaa boqor ka
noqday wiilkiisii Yootam. 8 Oo Casaryaah oo ahaa boqorkii
dalka Yahuudah sannaddiisii siddeed iyo soddonaad ayaa

Sekaryaah ina Yaaraabcaam dalka Israa'iil Samaariya boqor
ugu ahaa intii lix bilood ah. **9** Oo isna wuxuu sameeyey
wax Rabbiga hortiisa shar ku ah, siday awowayaashiis
yeeli jireen oo kale; oo kamana uu tegin dembiyadii uu
Yaaraabcaam ina Nebaad dadkii Israa'iil dembaajiyey. **10**
Oo waxaa isagii shirqoolay Shalluum ina Yaabeesh, oo
wax buu ku dhuftay dadka hortiisii, wuuna dilay, markaasuu
meeshiisiina boqor ka noqday. **11** Haddaba Sekaryaah
falimihiisii kale waxay ku qoran yihiin kitaabkii taariikhda
boqorradii dalka Israa'iil. **12** Kanu wuxuu ahaa eraygii
Rabbigu kula hadlay Yeehuu, ee uu ku yidhi, Farcankaaga
qarniga afraad ah ayaa ku fadhiisan doona carshiga dalka
Israa'iil. Oo saasay noqotay. **13** Oo Shalluum ina Yaabeesh
wuxuu boqor noqday Cusiyaah oo ahaa boqorkii dalka
Yahuudah sannaddiisii sagaal iyo soddonaad, oo muddo
bil ah ayuu Samaariya boqor ku ahaa. **14** Markaasaa
Menaxeem ina Gaadii ayaa ka kacay Tirsaah, oo wuxuu
tegey Samaariya, markaasuu Shalluum ina Yaabeesh ku
dilay Samaariya oo meeshiisii boqor ka noqday. **15** Haddaba
Shalluum falimihiisii kale iyo shirqoolkii uu sameeyeyba
waxay ku qoran yihiin kitaabkii taariikhda boqorradii dalka
Israa'iil. **16** Haddaba Menaxeem wuu wada laayay Tifsax iyo
wixii ku jiray oo dhan, iyo soohdimaheedii marka Tirsaah
laga bilaabo, maxaa yeelay, way ka furi waayeen, sidaas
daraaddeed buuna u laayay; oo naagihii uurka lahaa oo
magaalada ku jiray oo dhan wuu wada dooxay. **17** Casaryaah
oo ahaa boqorkii dalka Yahuudah sannaddiisii sagaal iyo
soddonaad ayaa Menaxeem ina Gaadii dalka Israa'iil boqor
ka noqday, oo Samaariya ayuu toban sannadood boqor ku
ahaa. **18** Oo wuxuu sameeyey wax Rabbiga hortiisa shar ku
ah; oo isagu wakhtigiisii oo dhan kama uu tegin dembiyadii
uu Yaaraabcaam ina Nebaad dadka Israa'iil dembaajiyey.
**19** Markaasaa waxaa waddankii ku kacay Fuul oo ahaa
boqorkii Ashuur; oo Menaxeem ayaa Fuul kun talanti oo
lacag ah siiyey inuu gacan ku siiyo si ay boqortooyadu
ugu xoogaysato. **20** Oo Menaxeem wuxuu lacagtii saaray
dadkii taajiriinta ahaa oo dalka Israa'iil oo dhan, oo wuxuu
ku amray in nin waluba konton sheqel oo lacag ah bixiyo
si loo siiyo boqorka Ashuur, sidaas daraaddeed boqorkii
Ashuur dib buu u noqday oo dalkiina siima uu joogin. **21**
Haddaba Menaxeem falimihiisii kale iyo wixii uu sameeyey
oo dhammu sow kuma qorna kitaabkii taariikhda boqorradii
dalka Israa'iil? **22** Markaasaa Menaxeem dhintay oo la
seexday awowayaashiis, oo meeshiisiina waxaa boqor ka
noqday wiilkiisii Fiqaxyaah. **23** Casaryaah oo ahaa boqorkii
dalka Yahuudah sannaddiisii kontonaad ayaa Fiqaxyaah
ina Menaxeem dalka Israa'iil Samaariya boqor ugu noqday,
oo wuxuu boqor ahaa laba sannadood. **24** Oo isna wuxuu
sameeyey wax Rabbiga hortiisa shar ku ah, oo kama uu
tegin dembiyadii uu Yaaraabcaam ina Nebaad dadka Israa'iil
dembaajiyey. **25** Oo waxaa isagii shirqoolay sirkaalkiisii
Feqax ina Remalyaah ahaa oo wuxuu isagii qalcaddii guriga
boqorka kula dilay Argob iyo Aryaah; oo waxaa isaga la
jiray konton nin oo reer Gilecaad ah; oo markuu isagii dilay
ayuu meeshiisii boqor ka noqday. **26** Haddaba Fiqaxyaah
falimihiisii kale iyo wixii uu sameeyey oo dhammuba waxay
ku wada qoran yihiin kitaabkii taariikhda boqorradii dalka
Israa'iil. **27** Casaryaah oo ahaa boqorkii dalka Yahuudah
sannaddiisii laba iyo kontonaad ayaa Feqax ina Remalyaah
dalka Israa'iil Samaariya boqor ugu noqday, oo wuxuu boqor
ahaa labaatan sannadood. **28** Oo isaguna wuxuu sameeyey
wax Rabbiga hortiisa shar ku ah, kamana uu tegin dembiyadii
uu Yaaraabcaam ina Nebaad dadka Israa'iil dembaajiyey. **29**
Oo wakhtigii Feqax boqorka ka ahaa dalka Israa'iil waxaa
yimid Tiglad Fileser oo ahaa boqorka Ashuur, oo wuxuu
qabsaday Ciyoon, iyo Aabeel Beytmacakaah, iyo Yaanoo'ax,
iyo Qedesh, iyo Xaasoor, iyo Gilecaad, iyo Galili, iyo dalkii
reer Naftaali oo dhan, oo dadkiina maxaabiis ahaan ayuu
Ashuur ugu kaxaystay. **30** Hoosheeca ina Eelaah ayaa Feqax
ina Remalyaah shirqoolay, oo intuu wax ku dhuftay ayuu dilay,
oo meeshiisiina boqor buu ka noqday sannaddii labaatanaad
oo Yootam ina Cusiyaah. **31** Haddaba Feqax falimihiisii kale
iyo wixii uu sameeyey oo dhammuba waxay ku wada qoran
yihiin kitaabkii taariikhda boqorradii dalka Israa'iil. **32** Feqax
ina Remalyaah oo ahaa boqorkii dalka Israa'iil sannaddiisii
labaad ayaa Yootam ina Cusiyaah dalka Yahuudah boqor
ka noqday. **33** Oo markuu boqor noqday wuxuu jiray shan
iyo labaatan sannadood, oo Yeruusaalem ayuu boqor ku
ahaa lix iyo toban sannadood, oo hooyadiis magaceedana
waxaa la odhan jiray Yeruushaah ina Saadooq. **34** Oo isna
wuxuu sameeyey wax Rabbiga hortiisa ku qumman, oo
wuxuu wada yeelay sidii aabbihiis Cusiyaah yeelay oo kale.
**35** Habase yeeshee meelihii sarsare lama baabbi'in, oo
dadkuna weli way ku allabaryi jireen, fooxna bay ku shidi
jireen meelihii sarsare. Oo isagu wuxuu dhisay iriddii sare
oo gurigii Rabbiga. **36** Haddaba Yootam falimihiisii kale iyo
wixii uu sameeyey oo dhammuba sow kuma qorna kitaabkii
taariikhda boqorradii dalka Yahuudah? **37** Oo waagaas
Rabbigu wuxuu bilaabay inuu dalka Yahuudah ku soo diro
Resiin oo ahaa boqorkii Suuriya iyo Feqax ina Remalyaah.
**38** Markaasaa Yootam dhintay oo la seexday awowayaashiis,
oo waxaa awowayaashiis lagula aasay magaaladii awowgiis
Daa'uud, oo meeshiisiina waxaa boqor ka noqday wiilkiisii
Aaxaas.

**16** Feqax ina Remalyaah sannaddiisii toddoba iyo tobnaad
ayaa Aaxaas ina Yootam boqor ka noqday dalka
Yahuudah. **2** Aaxaas markuu boqor noqday wuxuu jiray
labaatan sannadood; oo lix iyo toban sannadood ayuu
Yeruusaalem boqor ku ahaa; oo isagu ma uu samayn sidii
awowgiis Daa'uud oo kale wax Rabbiga Ilaahiisa ah hortiisa
ku qumman. **3** Laakiinse wuxuu ku socday jidkii boqorrada
dalka Israa'iil; oo weliba wiilkiisii ayuu dab dhex mariyey
sidii ay ahayd karaahiyadii quruumihii Rabbigu ka eryay
reer binu Israa'iil hortooda. **4** Oo isna wuxuu ku allabaryi
jiray, fooxna ku shidi jiray meelihii sarsare, iyo buuraha
dushooda, iyo geed kastoo dheer oo doog ah hoostiisaba. **5**
Markaasaa waxaa Yeruusaalem ku soo kacay Resiin oo ahaa
boqorkii Suuriya iyo Feqax ina Remalyaah oo ahaa boqorkii
dalka Israa'iil inay la diriraan; wayna hareereeyeen Aaxaas,
laakiinse way ka adkaan kari waayeen. **6** Oo waagaas Resiin
oo ahaa boqorkii reer Suuriya wuxuu Suuriya u soo celiyey
Eelad, oo Yuhuuddiina wuu ka eryay Eelad, markaasay reer
Suuriya Eelad yimaadeen, oo ilaa maantana way deggan
yihiin. **7** Sidaas daraaddeed Aaxaas wuxuu farriin u diray
Tiglad Fileser oo ahaa boqorkii Ashuur, oo wuxuu ku yidhi,
Anigu waxaan ahay addoonkaagii iyo wiilkaagiiba, haddaba
ii kaalay oo iga badbaadi boqorka Suuriya iyo boqorka
dalka Israa'iil kuwaas oo igu kacay. **8** Oo Aaxaas wuxuu
qaaday lacagtii iyo dahabkii laga helay gurigii Rabbiga iyo
khasnadihii gurigii boqorkaba, oo wuxuu hadiyad ahaan
ugu diray boqorkii Ashuur. **9** Oo boqorkii Ashuurna wuu
maqlay; markaasaa boqorkii Ashuur Dimishaq ku kacay
oo qabsaday, oo dadkiina maxaabiis ahaan buu Qiir ugu
kaxaystay, oo Resiinna wuu dilay. **10** Oo Boqor Aaxaasna
wuxuu Dimishaq u tegey inuu Tiglad Fileser oo ahaa boqorkii
Ashuur la kulmo, oo wuxuu arkay meeshii allabariga ee
Dimishaq ku tiil; markaasaa Boqor Aaxaas wuxuu wadaadkii
Uuriyaah ahaa u diray tilmaantii meeshii allabariga siday u
ekayd iyo siduu hanaankeedu ahaa iyo sidii loo sameeyey
oo dhan. **11** Markaasaa wadaadkii Uuriyaah ahaa u dhisay
meel allabari sidii Boqor Aaxaas Dimishaq ka soo diray
oo kale, oo wadaadkii Uuriyaah ahaa taas buu sameeyey
intuusan Boqor Aaxaas Dimishaq ka iman. **12** Oo markuu
boqorkii Dimishaq ka yimid wuxuu arkay meeshii allabariga,
markaasuu u dhowaaday meeshii allabariga oo wax buu ku
dul bixiyey. **13** Oo wuxuu meeshii allabariga ku dul gubay
qurbaankiisii la gubi jiray iyo qurbaankiisii hadhuudhka ahaa,
oo qurbaankiisii cabniinka wuu ku dul shubay, oo wuxuu ku
saydhsaydhay dhiiggii qurbaannadiisii nabaadiinada. **14** Oo
meeshii allabariga ee naxaasta ahayd oo Rabbiga hor tiilna
wuu ka soo qaaday guriga hortiisii iyo meeshii u dhexaysay
meeshiisa allabariga iyo gurigii Rabbiga, oo wuxuu dhigay
meeshiisii allabariga dhinaceeda woqooyi. **15** Oo Boqor
Aaxaas wuxuu amray wadaadkii Uuriyaah ahaa, oo ku yidhi,
Meesha allabariga oo weyn waxaad dusheeda ku gubtaa
qurbaanka la gubo oo subaxda, iyo qurbaanka hadhuudhka
ah oo fiidnimada, iyo qurbaanka la gubo ee boqorka, iyo
qurbaankiisa hadhuudhka ah, iyo qurbaanka la gubo oo
dadka dalka deggan oo dhan, iyo qurbaankooda hadhuudhka
ah, iyo qurbaannadooda cabniinka; oo dhiigga qurbaanka
la gubo oo dhanna dusheeda ku saydhsaydh, iyo dhiigga
allabariga; laakiinse meesha allabariga ee naxaasta ahu ha
ahaato mid aan wax ku weyddiisto. **16** Haddaba wadaadkii
Uuriyaah ahaa sidaasuu u wada yeelay wixii Boqor Aaxaas
ku amray oo dhan. **17** Oo Boqor Aaxaasna wuxuu jaray
saldhigyadii darfahoodii, oo berkeddii weysadana wuu ka
kor qaaday, oo berkeddii naxaasta ahaydna wuu ka dejiyey
dibidii hoosteeda ku jirtay, oo wuxuu saaray meel sallax
ah. **18** Oo boqorkii Ashuur aawadiis ayuu gurigii Rabbiga
ugu soo beddelay meeshii daboolnayd ee sabtida ee guriga
looga dhex dhisay iyo meeshii boqorku ka soo geli jirayba.
**19** Haddaba Aaxaas falimihiisii kale ee uu sameeyey sow
kuma qorna kitaabkii taariikhda boqorradii dalka Yahuudah?
**20** Markaasaa Aaxaas dhintay oo la seexday awowayaashiis,
oo waxaa awowayaashiis lagula aasay magaaladii Daa'uud;
meeshiisiina waxaa boqor ka noqday wiilkiisii Xisqiyaah.

**17** Aaxaas oo ahaa boqorkii dalka Yahuudah sannaddiisii
laba iyo tobnaad ayaa Hoosheeca ina Eelaah dalka
Israa'iil Samaariya boqor ugu noqday, oo wuxuu boqor
ahaa sagaal sannadood. **2** Oo wuxuu sameeyey wax shar
ku ah Rabbiga hortiisa, laakiinse uma uu samayn sidii
boqorradii dalka Israa'iil oo isaga ka horreeyey. **3** Oo waxaa
isagii ku kacay Shalmaneser oo ahaa boqorkii Ashuur; oo
Hoosheeca addoon buu u noqday isagii, oo wuxuu u keenay
gabbaro. **4** Markaasaa boqorkii Ashuur wuxuu Hoosheeca
ka gartay shirqool, waayo, wuxuu wargeeyayaal u dirtay
Soowa oo boqorkii Masar ahaa, oo boqorkii Ashuurna
gabbaro ma uu siin siduu sannad kasta yeeli jiray; sidaas
daraaddeed boqorkii Ashuur wuu xidhay oo xabsi ku riday. **5**
Markaasaa boqorkii Ashuur dalkii oo dhan dhex maray, oo
wuxuu yimid Samaariya, oo intii saddex sannadood ah ayuu
hareereeyey. **6** Oo Hoosheeca sannaddiisii sagaalaad ayaa
boqorkii Ashuur qabsaday Samaariya, oo dadkii Israa'iilna
wuxuu u kaxaystay Ashuur, oo wuxuu dejiyey Xalax, iyo
Xaaboor oo webigii Goosaan ag ahaa, iyo magaalooyinkii
reer Maaday. **7** Oo taasu way dhacday, maxaa yeelay,
dadkii Israa'iil waxay ku dembaabi jireen Rabbiga Ilaahooda

ah oo iyaga ka soo bixiyey dalkii Masar oo ka soo hoos
bixiyey gacantii Fircoon oo ahaa boqorkii Masar, oo waxay
ka cabsan jireen ilaahyo kale, 8 wayna ku socon jireen
qaynuunnadii quruumaha kale, kuwaasoo Rabbigu ka eryay
dadka Israa'iil hortooda, iyo kuwii ay boqorradii dadkii Israa'iil
samaysteenba. 9 Oo dadkii Israa'iil waxay Rabbiga Ilaahooda
ah si qarsoon ugu samayn jireen waxyaalo aan qummanayn,
oo magaalooyinkooda oo dhan waxay ka dhisan jireen
meelo sarsare tan iyo munaaraddii waardiyayaasha iyo
ilaa magaaladii deyrka lahayd. 10 Oo buur kasta oo dheer
korkeeda iyo geed kastoo dheer oo doog ah hoostiisaba
waxay qotonsan jireen tiirar iyo geedihii Asheeraah. 11 Oo
meelihii sarsare oo dhan waxay ku shidi jireen foox sidii ay
yeeli jireen quruumihii kale oo Rabbigu uu hortooda ka eryay;
oo waxay samayn jireen waxyaalo shar ah oo ay Rabbiga
kaga xanaajiyeen. 12 Oo waxay u adeegi jireen sanamyadii
uu Rabbigu ku yidhi, Idinku waxan ha samaynina. 13 Oo
weliba Rabbigu dadkii Israa'iil iyo dadkii Yahuudahba wuxuu
ugu digi jiray nebiyadii oo dhan iyo kuwii wax arki jiray oo
dhan, isagoo leh, War jidadkiinna sharka ah ka soo noqda,
oo amarradayda iyo qaynuunnadayda u dhawra siduu ahaa
sharcigii aan awowayaashiin ku amray oo dhan oo aan
idinkugu soo dhiibay addoommadaydii nebiyada ahaa. 14
Habase yeeshee iyagu way diidi jireen inay taas maqlaan,
laakiinse waxay u madax adkaan jireen sidii awowayaashood
oo kale, kuwaasoo aan rumaysan Rabbiga Ilaahooda ah.
15 Oo iyagu way diidi jireen qaynuunnadiisii iyo axdigiisii
uu awowayaashood la dhigtay, iyo markhaatifurkiisii uu
iyaga ugu marag furay, oo intay waxtarla'aan raaceen ayay
wax aan waxba tarin noqdeen, oo waxay ku dayan jireen
quruumihii hareerahooda ku wareegsanaa oo Rabbigu ku
amray inayan sidooda oo kale yeelin. 16 Oo iyagu way ka
tegi jireen amarradii Rabbiga Ilaahooda ah oo dhan, oo
waxay samaysteen sanamyo la shubay, kuwaasoo ahaa laba
weylood, oo waxay kaloo samaysteen geedihii Asheeraah,
oo waxay caabudi jireen ciidanka samada oo dhan, Bacalna
way u adeegi jireen. 17 Oo wiilashoodii iyo gabdhahoodii ayay
dab dhex marin jireen, oo waxay u tegi jireen waxsheegyo
iyo falanfallowyo, oo waxay nafsaddoodii u iibin jireen
inay sameeyaan wax shar ku ah Rabbiga hortiisa, oo ay
kaga xanaajiyeen. 18 Sidaas daraaddeed Rabbigu aad buu
ugu cadhooday reer binu Israa'iil, markaasuu hortiisa ka
fogeeyey; oo iyagii waxba kama hadhin qabiilkii Yahuudah
oo keliya mooyaane. 19 Oo xataa reer Yahuudahna ma ayan
dhawrin amarradii Rabbiga Ilaahooda ah, laakiinse waxay
ku socdeen qaynuunnadii ay dadkii Israa'iil sameeyeen.
20 Oo Rabbigu wuxuu nacay farcankii reer binu Israa'iil
oo dhan, oo intuu dhibay ayuu gacanta u geliyey kuwii
dhacay ilaa uu hortiisa ka tuuray. 21 Waayo, isagu reer binu
Israa'iil wuu ka soocay Daa'uud reerkiisii, oo waxay boqor ka
dhigteen Yaaraabcaam ina Nebaad, oo Yaaraabcaamna
dadkii Israa'iil wuu ka kaxeeyey Rabbiga lasocodkiisii,
oo wuxuu iyagii dembaajiyey dembi weyn. 22 Oo dadkii
Israa'iil waxay ku socdeen kulli dembiyadii Yaaraabcaam
sameeyey oo dhan, oo kuwaasna kama ay tegin 23 ilaa uu
Rabbigu dadkii Israa'iil hortiisa ka fogeeyey, siduu kaga hadli
jiray addoommadiisii nebiyada ahaa oo dhan. Oo sidaas
daraaddeed dadkii Israa'iil waa laga kaxaystay dalkoodii, oo
waxaa lala tegey dalka Ashuur, halkaasoo ay ilaa maantadan
joogaan. 24 Markaasaa boqorkii Ashuur dad ka keenay
xagga Baabuloon, iyo Kuutaah, iyo Cawaa, iyo Xamaad, iyo
Sefarwayiim, oo wuxuu dejiyey magaalooyinkii Samaariya,
meeshay dadkii Israa'iil ka degganaan jireen, oo waxay
hantiyeen Samaariya, magaalooyinkeediina way degeen.
25 Oo markay bilaabeen inay meeshaas degaan Rabbiga
kama ay cabsan jirin, oo sidaas daraaddeed Rabbigu wuxuu
dhexdooda u soo diray libaaxyo, kuwaasoo iyagii qaar ka
laayay. 26 Sidaas daraaddeed boqorkii Ashuur ayaa lala
hadlay oo lagu yidhi, War quruumihii aad kaxaysay oo
aad magaalooyinka Samaariya dejisay ma ay yaqaaniin
camalka Ilaaha dalkaas, oo sidaas daraaddeed wuxuu
dhexdooda u soo diray libaaxyo, oo bal eeg, libaaxyadu
way laayaan, maxaa yeelay, iyagu ma ay yaqaaniin camalka
Ilaaha dalkaas. 27 Markaasaa boqorkii Ashuur wuxuu bixiyey
amar, oo yidhi, Wadaaddadii aad ka soo kaxayseen midkood
halkaas ku celiya, oo halkaas ha tago oo ha dego, dadkana
ha baro camalka Ilaaha dalkaas. 28 Haddaba wadaaddadii
ay Samaariya ka soo kaxeeyeen midkood ayaa yimid, oo
wuxuu degay Beytel, oo wuxuu dadkii baray siday Rabbiga
uga cabsan lahaayeen. 29 Habase yeeshee quruun waluba
waxay samaysatay ilaahyo ay iyagu leeyihiin, oo waxay dhex
dhigteen guryihii meelaha sarsare oo ay reer Samaariya
samaysteen, oo quruun waluba waxay dhex dhigteen
magaalooyinkii ay iyagu degganaayeen. 30 Oo dadkii reer
Baabuloon waxay samaysteen Sukood Benood, dadkii reer
Kuudna waxay samaysteen Neergal, dadkii reer Xamaadna
waxay samaysteen Ashiimaa, 31 oo reer Cawaana waxay
samaysteen Nibxas iyo Tartaq, oo reer Sefarwayiimna waxay
carruurtoodii dab ugu gubeen Adrammeleg iyo Canammeleg
oo ahaa ilaahyadii reer Sefarwayiim. 32 Rabbiga way
ka cabsan jireen oo waxay dadkooda ka dooran jireen
wadaaddadii meelaha sarsare, kuwaasoo ugu allabaryi jiray
guryihii meelaha sarsare. 33 Rabbiga way ka cabsan jireen,
isla markaasna waxay u adeegi jireen ilaahyadoodii sidii

quruumihii iyaga laga soo dhex kaxeeyey ay yeeli jireen. **34**
Oo ilaa maantadan waxay sameeyaan sidii caadooyinkoodii
hore ay ahaayeen, oo Rabbiga kama cabsadaan, mana
ay sameeyaan qaynuunnadoodii, iyo xukummadoodii, iyo
sharcigii iyo amarkii uu Rabbigu amray reer Yacquub, kii uu
Israa'iil u bixiyey, **35** kuwaasoo uu Rabbigu axdi la dhigtay,
oo uu ku amray, isagoo leh, Idinku ilaahyo kale ha ka
cabsanina, hana u sujuudina, hana u adeegina, allabarina ha
u bixinina; **36** laakiinse waxaad ka cabsataan Rabbigii dalkii
Masar idinkaga soo bixiyey xoogga weyn iyo cudud fidsan,
isagana u sujuuda oo allabari u bixiya; **37** oo qaynuunnadii,
iyo xukummadii, iyo sharcigii, iyo amarkii uu idiin qoray waa
inaad dhawrtaan oo aad weligiinba samaysaan, oo waa
inaydnaan ka cabsan ilaahyo kale. **38** Oo axdigii aan idinla
dhigtayna waa inaydnaan illoobin, oo aydnaan ilaahyo kale
ka cabsan; **39** laakiinse waxaad ka cabsataan Rabbiga
Ilaahiinna ah, oo isna wuxuu idinka samatabbixin doonaa
gacanta cadaawayaashiinna oo dhan. **40** Habase yeeshee
iyagu ma ayan dhegaysan, laakiinse waxay sameeyeen
sidii caadadoodii hore ay ahayd. **41** Quruumahaasu waxay
ka cabsan jireen Rabbiga, isla markaasna waxay u adeegi
jireen sanamyadoodii xardhanaa, oo carruurtoodiina saasoo
kalay yeeleen, oo carruurtii carruurtooduna saasoo kalay
yeeleen, oo sidii awowayaashood samayn jireen ayay
iyaguna sameeyaan ilaa maantadan la joogo.

**18** Haddaba Hoosheeca ina Eelaah oo ahaa boqorkii
dalka Israa'iil sannaddiisii saddexaad ayaa Xisqiyaah
ina Aaxaas dalka Yahuudah boqor ka noqday. **2** Oo markuu
boqor noqday wuxuu jiray shan iyo labaatan sannadood,
oo Yeruusaalem boqor buu ka ahaa sagaal iyo labaatan
sannadood, oo hooyadiisna magaceeda waxaa la odhan
jiray Abii ina Sekaryaah. **3** Oo isna wuxuu sameeyey wax
Rabbiga hortiisa ku qumman, sidii dhammaan awowgiis
Daa'uud sameeyey oo kale. **4** Wuxuu dumiyey meelihii
sarsare, tiirarkiina wuu jejebiyey, geedihii Asheeraahna
wuu jaray; oo wuxuu kaloo burburiyey abeesadii naxaasta
ahayd oo Muuse sameeyey, waayo, ilaa wakhtigaas dadkii
Israa'iil foox bay u shidi jireen, oo isna wuxuu magaceedii u
bixiyey Nexushtaan. **5** Oo wuxuu isku halleeyey Rabbiga
ah Ilaaha reer binu Israa'iil; oo dabadiis boqorradii dalka
Yahuudah oo dhan laguma arag mid isagii la mid ah, hortiisna
ma jirin. **6** Waayo, Rabbiguu xajistay, oo lasocodkiisiina
kama uu tegin, laakiinse wuxuu dhawray amarradiisii uu
Rabbigu Muuse ku amray. **7** Oo Rabbigu isaga wuu la
jiray, oo meel alla meeshuu tegeyba wuu ku liibaanay,
oo wuxuu ka fallaagoobay boqorkii Ashuur oo umana
adeegin. **8** Oo reer Falastiinna wuxuu ku laayay Gaasa iyo
soohdimaheeda, iyo tan iyo munaaraddii waardiyayaasha
iyo ilaa magaaladii deyrka lahayd. **9** Oo sannaddii afraad ee
Boqor Xisqiyaah, taasoo ahayd sannaddii toddobaad ee
Hoosheeca ina Eelaah oo boqorkii dalka Israa'iil ahaa ayuu
Shalmaneser oo ahaa boqorkii Ashuur Samaariya ku kacay
oo hareereeyey. **10** Oo saddex sannadood dabadeedna way
qabsadeen, taasuna waxay ahayd Xisqiyaah sannaddiisii
lixaad, oo ahayd Hoosheeca oo boqorkii dalka Israa'iil ahaa
sannaddiisii sagaalaad markii Samaariya la qabsaday. **11**
Markaasaa boqorkii Ashuur kaxaystay dadkii Israa'iil oo
wuxuu dejiyey Xalax iyo Xaaboor oo webiga Goosaan ag
ahaa, iyo magaalooyinkii reer Maaday, **12** maxaa yeelay, ma
ay addeecin codkii Rabbiga Ilaahooda ahaa, laakiinse way
ku xadgudbeen axdigiisii iyo dhammaan wixii uu midiidinkii
Rabbiga oo Muuse ahaa ku amray; ma ay maqlin, mana
ay samayn. **13** Haddaba Boqor Xisqiyaah sannaddiisii afar
iyo tobnaad ayaa Seenxeeriib oo ahaa boqorkii Ashuur ku
kacay magaalooyinkii deyrka lahaa oo dalka Yahuudah oo
dhan, wuuna qabsaday. **14** Markaasaa Xisqiyaah oo ahaa
boqorkii dalka Yahuudah ayaa boqorkii Ashuur ugu cid diray
Laakiish, oo wuxuu yidhi, Xumaan baan sameeyey, haddaba
iga noqo, oo anna wixii aad i saarto waan aqbalayaa.
Markaasaa boqorkii Ashuur wuxuu boqorkii dalka Yahuudah
saaray saddex boqol oo talanti oo lacag ah iyo soddon
talanti oo dahab ah. **15** Markaasaa Xisqiyaah wuxuu isagii
siiyey kulli lacagtii laga helay gurigii Rabbiga iyo khasnadihii
gurigii boqorka oo dhanba. **16** Oo waagaasaa Xisqiyaah
dahabkii ka jaray albaabbadii gurigii Rabbiga iyo tiirarkiiba,
kuwaasoo uu Xisqiyaah oo ahaa boqorkii dalka Yahuudah ku
dahaadhay, oo wuxuu siiyey boqorkii Ashuur. **17** Markaasaa
boqorkii Ashuur wuxuu Laakiish ka diray Tartaan iyo Rab
Saariis iyo Rabshaaqeeh oo ciidan faro badan wata, oo
wuxuu iyaga Boqor Xisqiyaah ugu diray Yeruusaalem. Oo
iyana intay kaceen ayay Yeruusaalem tageen. Oo markay
yimaadeen waxay is-ag taageen biyomareenkii balliga sare
kaasoo ku dhex yiil waddada berrinkii dharmaydhaha. **18**
Oo markay boqorkii u yeedheen waxaa iyagii u yimid
Elyaaqiim ina Xilqiyaah oo u sarreeyey reerkii boqorka, iyo
Shebnaa oo karraanigii ahaa, iyo Yoo'aax ina Aasaaf oo
ahaa taariikhqorihii. **19** Markaasaa Rabshaaqeeh wuxuu
iyagii ku yidhi, Waxaad Xisqiyaah haddeer ku tidhaahdaan,
Boqorka weyn ee boqorka Ashuur ah wuxuu kugu leeyahay,
War waxaad ku kalsoon tahay oo aad isku hallaynaysaa
waa maxay? **20** Adigu waxaad leedahay, Dagaalka waxaa
loo hayaa talo iyo xoog, laakiinse afka uun baad ka
tidhi. Haddaba waadiga iga fallaagoobaye bal yaad isku

hallaynaysaa? 21 Bal ogow, waxaad isku hallaynaysaa oo ul
ahaan u qaadanaysaa cawsduurkan burburay, kaasoo ah
Masar, oo isna haddii nin ku tiirsado gacantuu ka galaa oo
ka mudaa; oo boqorka Masar oo Fircoon ahu saasoo kaluu
u yahay kuwa isaga isku halleeya oo dhan. 22 Laakiinse
haddaad igu tidhaahdaan, Waxaannu isku hallaynaynaa
Rabbiga Ilaahayaga ah, miyuusan isagu ahayn kii meelihiisii
sarsare iyo meelihiisii allabarigaba uu Xisqiyaah wada
dumiyey isagoo dadka Yahuudah iyo dadka Yeruusaalemba
ku leh, Meeshan allabariga ee Yeruusaalem ku taal horteeda
waa inaad Ilaah ku caabuddaan? 23 Haddaba waan ku
baryayaaye bal sharad la dhigo sayidkayga oo ah boqorka
Ashuur, haddaba waxaan ku siin doonaa laba kun oo faras,
haddaad rag fuula u heli kartid. 24 Bal sidee baad u celin
kartaa sirkaal ka mid ah kuwa ugu yaryar ee addoommada
sayidkayga ah, oo sidee baad Masar isugu hallaynaysaa
inay ku siinayso gaadhifardood iyo rag fardooley ah? 25
Haddaba miyaan Rabbiga la'aantiis ugu kacay meeshan
inaan baabbi'iyo? Rabbigu wuxuu igu yidhi, Dalkaas ku kac
oo soo baabbi'i. 26 Markaasaa Elyaaqiim ina Xilqiyaah iyo
Shebnaa iyo Yoo'aax waxay Rabshaaqeeh ku yidhaahdeen,
Waan ku baryaynaaye nagula hadal afka reer Suuriya,
annagoo addoommadaada ah, isagaannu garanaynaa; oo ha
nagula hadlin afka Yuhuudda iyadoo dadka derbiga dul jooga
ay na maqlayaan. 27 Laakiinse Rabshaaqeeh wuxuu iyagii
ku yidhi, Sayidkaygu ma wuxuu ii soo diray inaan sayidkiinna
iyo idinka eryadan kula hadlo? Sow iima uu soo dirin
nimanka derbiga dul joogaa inay saxaradooda cunaan oo ay
kaadidooda idinla cabbaan? 28 Markaasuu Rabshaaqeeh
istaagay, oo intuu cod weyn ku qayliyey ayuu afka Yuhuudda
ku hadlay oo yidhi, War maqla eraygii boqorka weyn ee
ah boqorka Ashuur. 29 Boqorkii wuxuu idinku leeyahay,
Xisqiyaah yuusan idin khiyaanayn, waayo, isagu ma uu
awoodi doono inuu gacantiisa idinka samatabbixiyo. 30 Oo
weliba Xisqiyaah yuusan Rabbiga idin aaminsiin isagoo
leh, Hubaal Rabbigu waa ina samatabbixin doonaa, oo
magaaladan laguma ridi doono gacanta boqorka Ashuur. 31
Haddaba Xisqiyaah ha maqlina, waayo, boqorkii Ashuur
wuxuu leeyahay, Nabad ila dhigta, oo ii soo baxa, oo midkiin
waluba wax ha ka cuno canabkiisa iyo geedkiisa berde, oo
midkiin waluba ha cabbo biyaha ceelkiisa, 32 intaanan iman
oo idiin kaxayn dal dalkiinna la mid ah, oo ah dal hadhuudh
iyo khamri leh, oo ah dal cunto iyo beerocanab leh, oo
ah dal saliid saytuun iyo malab leh inaad noolaataan oo
aydnaan dhiman. Oo Xisqiyaah ha maqlina markuu idinku
sasabayo oo idin leeyahay, Rabbigu waa ina samatabbixin
doonaa. 33 Bal quruumaha ilaahyadoodii midkoodna miyuu
weligiis dalkiisa ka samatabbixiyey gacanta boqorka Ashuur?
34 Bal meeye ilaahyadii Xamaad iyo Arfaad? Oo meeye
ilaahyadii Sefarwayiim iyo Xeenac iyo Ciwaah? Iyagu miyey
Samaariya ka samatabbixiyeen gacantayda? 35 Bal waa
kuwee kuwa ku jira ilaahyada dalalka oo dhan oo dalkooda
ka samatabbixiyey gacantayda? Haddaba Rabbigu sidee
buu Yeruusaalem gacantayda uga samatabbixin karaa? 36
Laakiinse dadkii way iska aamuseen oo xataa eray keliya
uguma ay jawaabin, waayo, boqorku wuxuu ku amray oo
yidhi, Ha u jawaabina. 37 Markaasaa waxaa Xisqiyaah u
yimid Elyaaqiim ina Xilqiyaah oo reerka boqorka u sarreeyey,
iyo Shebnaa oo karraanigii ahaa, iyo Yoo'aax ina Aasaaf oo
taariikhqorihii ahaa, iyagoo dhar jeexjeexan, oo waxay isagii
u sheegeen Rabshaaqeeh erayadiisii.

19 Oo markii Xisqiyaah taas maqlay intuu dharkiisii
jeexjeexay oo joonyad guntaday ayuu gurigii Rabbiga
galay. 2 Markaasuu Elyaaqiim oo reerka boqorka u sarreeyey,
iyo Shebnaa oo karraanigii ahaa, iyo duqowdii wadaaddada,
iyagoo joonyado qaba u diray Nebi Ishacyaah oo ahaa ina
Aamoos. 3 Oo iyana waxay ku yidhaahdeen, Xisqiyaah
wuxuu kugu leeyahay, Maanta waa maalin dhibaato, iyo
canaan, iyo cay, waayo, carruurtii way dhalan lahayd laakiinse
xoog lagu dhalaa ma jiro. 4 Waxaa laga yaabaa in Rabbiga
Ilaahaaga ahu uu wada maqlo erayadii Rabshaaqeeh
oo dhan, kaasoo sayidkiisii ahaa boqorka Ashuur uu u
soo diray inuu caayo Ilaaha nool; waana suurtowdaa
inuu Rabbiga Ilaahaaga ahu canaanto kan uu erayadiisii
maqlay; haddaba sidaas daraaddeed u ducee kuwa hadhay.
5 Sidaas daraaddeed Boqor Xisqiyaah addoommadiisii
waxay u yimaadeen Ishacyaah. 6 Oo Ishacyaah wuxuu
ku yidhi, Waxaad sayidkiinnii ku tidhaahdaan, Rabbigu
wuxuu ku leeyahay, Ha ka cabsan erayadii aad maqashay
oo midiidinnadii boqorka Ashuur ay igu caayeen. 7 Bal
ogow, jinni baan gelin doonaa, oo belef buu maqli doonaa,
markaasuu ku noqon doonaa dalkiisii, oo waxaan ka dhigi
doonaa in isaga seef lagu dilo, isagoo dalkiisii jooga. 8
Markaasaa Rabshaaqeeh intuu noqday wuxuu helay boqorkii
Ashuur oo la diriraya Libnaah, waayo, wuxuu maqlay
inuu Laakiish ka tegey. 9 Oo markuu maqlay iyadoo la
leeyahay, Boqorka Itoobiya oo Tirhaaqaah ah ayaa kugu
soo baxay si uu kuula diriro ayuu haddana wargeeyayaal u
diray Xisqiyaah, isagoo leh, 10 Xisqiyaah oo ah boqorka
dalka Yahuudah waxaad ku tidhaahdaan, Ilaahaaga aad
isku hallaysaa yuusan ku khiyaanayn, isagoo kugu leh,
Yeruusaalem gacanta loo gelin maayo boqorka Ashuur. 11
Bal eeg, waad maqashay wixii ay boqorrada Ashuur dalalka
oo dhan ku sameeyeen, iyo sidii ay dhammaantood u wada

baabbi'iyeen; haddaba adiga ma lagu samatabbixinayaa? 12
Quruumihii ay awowayaashay baabbi'iyeen ilaahyadoodii
miyey samatabbixiyeen, kuwaasoo ahaa Goosaan, iyo
Xaaraan, iyo Resef, iyo reer Ceeden oo Telasaar degganaa?
13 Oo bal meeye boqorkii Xamaad, iyo boqorkii Arfaad,
iyo boqorkii magaalada Sefarwayiim, iyo kii Xeenac, iyo
kii Ciwaah? 14 Markaasaa Xisqiyaah warqaddii ka qaatay
gacantii wargeeyayaashii oo akhriyey, dabadeedna wuxuu
tegey gurigii Rabbiga oo warqaddii ku kala bixiyey Rabbiga
hortiisa. 15 Oo Xisqiyaah wuxuu ku baryootamay Rabbiga
hortiisa oo yidhi, Rabbiyow, Ilaaha reer binu Israa'iilow,
kan keruubiimta ku dul fadhiyow, waxaad tahay Ilaah, oo
adiga keligaa ayaa ah Ilaaha boqortooyooyinka dunida oo
dhan, oo cirka iyo dhulkana adigaa sameeyey. 16 Rabbiyow,
dhegta u dhig oo maqal, oo Rabbiyow, indhahaaga fur oo
arag; bal maqal Seenxeeriib erayadii uu u soo diray inuu
Ilaaha nool ku caayo. 17 Rabbiyow, sida runta ah boqorrada
Ashuur waxay baabbi'iyeen quruumihii iyo dalalkoodii, 18
oo ilaahyadoodiina dab bay ku dhex tuureen, waayo, iyagu
ilaahyo ma ay ahayn, laakiinse waxay ahaayeen wax gacanta
lagu sameeyey, oo ahaa qoryo iyo dhagaxyo, oo sidaas
daraaddeed iyagu way baabbi'iyeen. 19 Haddaba sidaas
daraaddeed Rabbiyow Ilaahayagow, waan ku baryayaaye
gacantiisa naga badbaadi, in boqortooyooyinka dunida oo
dhammu ay ogaadaan inaad adiga keliyahu tahay Rabbiga
Ilaaha ah. 20 Markaasaa Ishacyaah ina Aamoos u soo cid
diray Xisqiyaah, oo wuxuu ku yidhi, Rabbiga Ilaaha reer binu
Israa'iil ahu wuxuu leeyahay, Seenxeeriib oo ah boqorka
Ashuur waad iga bariday, taas aawadeed waan ku maqlay.
21 Oo kanu waa erayguu Rabbigu isaga kaga hadlay:
Gabadha bikradda ah oo Siyoon Way ku fududaysatay,
oo intay kugu qososhay ayay ku quudhsatay; Gabadhii
Yeruusaalem madaxay kaa ruxatay. 22 Bal adigu kumaad
yaraysatay oo aad cayday? Oo bal yaad codkaaga kor ugu
qaadday Oo aad indhahaaga ku taagtay? Waa kan quduuska
ah oo reer binu Israa'iil. 23 Wargeeyayaashaadii ayaad
Sayidka ku cayday Oo waxaad tidhi, Gaadhifardoodkayga
badan Ayaan ku soo fuulay buuraha meesha ugu dheer,
Iyo meelaha ugu hooseeya ee Lubnaan gudaheeda; Oo
waxaan jari doonaa geedaheeda dhaadheer oo kedarka ah,
iyo geedaheeda la doortay oo berooshka ah, Oo waxaan geli
doonaa meesha ugu fog hoygeeda, iyo kaynta berrinkeeda
oo midhaha badan. 24 Anigu waxaan qoday oo cabbay
biyo qalaad, Oo calaacalaha cagahayga baan ku wada
qallajin doonaa Webiyaasha Masar oo dhan. 25 War sow
ma aad maqal Sidaan waa hore u sameeyey Oo aan
wakhtiyadii hore u qabanqaabiyey? Haddaba anigaa saas
kaa yeelay Inaad magaalooyin deyr leh baabbi'isid oo aad
ka dhigtid taallooyin burbur ah. 26 Oo sidaas daraaddeed
dadkii degganaa way xoog yaraayeen, Wayna naxeen oo
wareereen; Oo waxay ahaayeen sida cawska berrinka, iyo
sida doogga, Iyo sida cawska guryaha korkooda ka soo
baxa, iyo sida hadhuudh gubtay intaanu korin. 27 Laakiinse
waan aqaan fadhigaaga, Iyo bixiddaada, iyo soo geliddaada,
Iyo cadhadaadii aad ii cadhootayba. 28 Cadhadaadii aad
ii cadhootay, Iyo islaweynaantaadii waxay soo gaadheen
dhegahayga, Oo sidaas daraaddeed sanka waxaan kaa
sudhi doonaa qabatadayda, Bushimahaagana waxaan gelin
doonaa xakamahayga, Oo waxaan kugu celin doonaa jidkii
aad ku timid. 29 Oo tanu waxay kuu ahaan doontaa calaamad;
sannaddan waxaad cuni doontaan waxa iska soo baxa, oo
sannadda labaadna waxaad cuni doontaan wax kii hore uun
ka soo baxa; oo sannadda labaadna waxaad cuni doontaan
wax kii hore uun ka soo baxay; sannadda saddexaadna
idinku wax beerta, oo haddana goosta, oo beera canab ah
tabcada, oo midhahooda cuna. 30 Markaasaa kuwii hadhay
oo reer Yahuudah ah oo baxsaday mar kalay xididdo hoos u
bixin doonaan, midhona kor bay u dhali doonaan. 31 Waayo,
Yeruusaalem waxaa ka soo bixi doona kuwa hadhi doona,
oo Buur Siyoonna waxaa ka soo bixi doona kuwa baxsan
doona. Oo qiirada Rabbiga ayaa taas samayn doonta. 32
Haddaba Rabbigu saasuu uga hadlay boqorka Ashuur oo
yidhi, Isagu magaaladan iman maayo, fallaadhna ku soo
gani maayo, horteedana gaashaan la iman maayo, taallo
ciid ahna ag tuuli maayo. 33 Oo Rabbigu wuxuu leeyahay,
Jidkuu ku yimid ayuu ku noqon doonaa, oo magaaladan
iman maayo. 34 Waayo, anigu magaaladan waxaan u
daafici doonaa oo u badbaadin doonaa aniga daraadday iyo
addoonkaygii Daa'uud daraaddiis. 35 Oo isla habeenkaas
ayaa malaa'igtii Rabbigu baxday oo waxay xeradii reer
Ashuur ka laysay boqol iyo shan iyo siddeetan kun oo nin;
oo aroor hore markii la toosay waxay wada ahaayeen meyd.
36 Markaasaa Seenxeeriib oo ahaa boqorkii Ashuur intuu
tegey Nineweh ku noqday oo degay. 37 Oo markuu wax
ku caabudayay gurigii ilaahiis Nisrog ayay Adrammeleg iyo
Shareser isagii seef ku dileen; markaasay u carareen dalkii
Araarad. Oo meeshiisiina waxaa boqor ka noqday wiilkiisii
Eesar Xaddoon.

**20** Oo waagaas ayaa Xisqiyaah bukooday, oo geeri buu
u dhowaaday. Markaasaa Nebi Ishacyaah oo ahaa ina
Aamoos u yimid oo wuxuu ku yidhi, Rabbigu wuxuu leeyahay,
Reerkaaga la dardaaran, waayo, waad dhimanaysaa oo sii
noolaan maysid. 2 Oo isna markaasuu wejigiisii derbiga ku

sii jeediyey, oo Rabbiga baryay, oo yidhi, 3 Rabbiyow, waan
ku baryayaaye, bal haatan xusuuso sidaan hortaada ugu
socday runta iyo qalbi qumman, iyo sidaan u sameeyey waxa
hortaada ku wanaagsan. Xisqiyaahna aad buu u ooyay. 4 Oo
intaanu Ishacyaah weli magaalada dhexe u bixin ayaa eraygii
Rabbigu isagii u yimid oo ku yidhi, 5 Dib u noqo, oo Xisqiyaah
oo ah amiirka dadkayga waxaad ku tidhaahdaa, Rabbiga ah
Ilaaha awowgaa Daa'uud wuxuu leeyahay, Baryootankaagii
waan maqlay, ilmadaadiina waan arkay, haddaba waan
ku bogsiinayaa, oo maalinta saddexaad waxaad u bixi
doontaa guriga Rabbiga. 6 Oo cimrigaagiina waxaan kuugu
dari doonaa shan iyo toban sannadood, oo adiga iyo
magaaladanba waan ka samatabbixin doonaa gacanta
boqorka Ashuur, oo waxaan magaaladan u daafici doonaa
aniga daraadday iyo addoonkaygii Daa'uud daraaddiis. 7
Markaasaa Ishacyaah yidhi, Waxaad qaaddaan fud berde
ah, oo iyana way qaadeen, oo waxay saareen kasoobixii,
wuuna bogsaday. 8 Markaasaa Xisqiyaah wuxuu Ishacyaah
ku yidhi, Maxaa calaamad ii noqon doona in Rabbigu i
bogsiinayo oo aan maalinta saddexaad guriga Rabbiga u
baxayo? 9 Kolkaasaa Ishacyaah ku yidhi, Calaamadda
xagga Rabbiga kaaga imanaysa in Rabbigu samaynayo
wixii uu ballanqaaday waxay ahaan doontaa tan: hoosku
ma inuu hore u socdaa toban derejo mase waa inuu dib u
socdaa toban derejo? 10 Markaasaa Xisqiyaah wuxuu ugu
jawaabay, Waa wax fudud in hoosku toban derejo hore u
socdo; hase ahaatee, hoosku dib ha u soo noqdo toban
derejo, 11 Markaasaa Nebi Ishacyaah u qayliyey Rabbiga;
oo isna markaasuu hooskii toban derejo dib uga soo celiyey
intuu hore uga socday derejooyinkii Aaxaas. 12 Waagaas
Berodag Baladaan, oo ahaa ina Baladaan oo boqorkii
Baabuloon ahaa ayaa warqado iyo hadiyad Xisqiyaah u
soo diray, waayo, wuxuu maqlay in Xisqiyaah bukay. 13
Oo markaasuu Xisqiyaah iyagii maqlay oo wuxuu tusay
dhammaan gurigii ay yiilleen waxyaalihiisii qaaliga ahaa,
kuwaasoo ahaa lacagtii iyo dahabkii, iyo uunsigii iyo saliiddii
qaaliga ahayd, iyo gurigiisii hubka, iyo kulli waxyaalihii
khasnadihiisa ku jiray oo dhan. Oo Xisqiyaah wax uusan
iyaga tusin laguma arag gurigiisa iyo dowladdiisa oo dhan.
14 Markaasaa Nebi Ishacyaah u yimid Boqor Xisqiyaah,
oo wuxuu ku yidhi, War nimankanu maxay yidhaahdeen?
Xaggee bayse kaaga yimaadeen? Kolkaasaa Xisqiyaah
yidhi, Waxay ka yimaadeen dal fog, kaasoo ah Baabuloon.
15 Markaasuu ku yidhi, Maxay gurigaaga ku arkeen? Oo
Xisqiyaah wuxuu ugu jawaabay, Way wada arkeen waxa
gurigayga yaal oo dhan; oo khasnadahayga kuma jiraan wax
aanan tusin. 16 Kolkaasaa Ishacyaah wuxuu Xisqiyaah ku
yidhi, Haddaba bal maqal erayga Rabbiga. 17 Bal eeg, waxaa
iman doona maalmaha waxa gurigaaga yaal oo dhan iyo wixii
ay awowayaashaa ilaa maantadan kaydiyeen Baabuloon loo
qaadan doono. Rabbigu wuxuu leeyahay, Waxba ma hadhi
doonaan. 18 Wiilashaada kaa soo bixi doona oo aad dhali
doontana waa la kaxaysan doonaa; oo iyana waxay ahaan
doonaan bohommo jooga daarta boqorka Baabuloon. 19
Markaasaa Xisqiyaah wuxuu Ishacyaah ku yidhi, Erayga
Rabbiga oo aad ku hadashay waa wanaagsan yahay. Oo
weliba wuxuu kaloo yidhi, Mar haddii nabad iyo rumu ay
jirayaan intaan noolahay, sow ma wanaagsana? 20 Haddaba
Xisqiyaah falimihiisii kale, iyo xooggiisii oo dhan, iyo siduu u
sameeyey balliga iyo biyomareenka, iyo siduu magaalada
biyo ugu keenay, sow kuma qorna kitaabkii taariikhda
boqorradii dalka Yahuudah? 21 Markaasaa Xisqiyaah dhintay
oo la seexday awowayaashiis, oo waxaa meeshiisii boqor ka
noqday wiilkiisii Manaseh.

**21** Oo Manaseh markuu boqor noqday wuxuu jiray laba iyo
toban sannadood; oo Yeruusaalemna wuxuu boqor ka
ahaa shan iyo konton sannadood, oo hooyadiis magaceeduna
wuxuu ahaa Xefsiibaah. 2 Oo isna wuxuu sameeyey wax
Rabbiga hortiisa shar ku ahaa, sidii karaahiyadii quruumihii
Rabbigu ka eryay reer binu Israa'iil hortooda. 3 Waayo, wuxuu
mar kale dhisay meelihii sarsare ee aabbihiis Xisqiyaah
baabbi'iyey, oo Bacalna meelo allabari buu u dhisay, oo
geedo Asheeraahna wuu sameeyey siduu yeelay Axaab
oo ahaa boqorkii dalka Israa'iil, oo wuxuu caabuday oo
u wada adeegay ciidanka samada oo dhan. 4 Oo wuxuu
meelo allabari ka dhex dhisay gurigii Rabbiga, kaasoo
Rabbigu ka hadlay oo yidhi, Magacayga waxaan dhigayaa
Yeruusaalem dhexdeeda. 5 Oo wuxuu ciidanka samada oo
dhan meelo allabari uga dhisay labadii barxadood oo gurigii
Rabbiga. 6 Oo wiilkiisiina dab buu dhex mariyey, faalna wuu
ku noqnoqday, wuxuuna u tegey falanfallowyo, wuuna la
macaamilooday kuwii ruuxaanta lahaa iyo saaxiriintii, oo
wuxuu Rabbiga hortiisa ku sameeyey shar badan oo uu
isaga kaga xanaajiyey. 7 Oo sanamkii xardhanaa ee geedihii
Asheeraah ee uu sameeyey ayuu dhex qotomiyey gurigii
Rabbigu ka hadlay oo Daa'uud iyo wiilkiisii Sulaymaanba ku
yidhi, Gurigan iyo Yeruusaalem dhexdeeda oo aan ka doortay
qabiilooyinka reer binu Israa'iil oo dhan ayaan magacayga
weligiisba ku dayn doonaa. 8 Oo cagaha reer binu Israa'iilna
mar dambe ka dhigi maayo kuwo ka wareega dalkii aan
awowayaashood siiyey, hadday dhawraan uun wixii aan
ku amray oo dhan, iyo sharcigii addoonkaygii Muuse ku
amray oo dhan. 9 Laakiinse way dhegaysan waayeen, oo

Manaseh ayaa iyagii ku sasabay inay sameeyaan shar
ka sii badan kii ay sameeyeen quruumihii Rabbigu ku hor
baabbi'iyey reer binu Israa'iil. **10** Markaasaa Rabbigu ka
dhex hadlay nebiyadii addoommadiisa ahaa, oo yidhi, **11**
Manaseh oo ah boqorka dalka Yahuudah ayaa sameeyey
karaahiyadan, wuuna sameeyey shar ka sii badan kii reer
Amorkii isaga ka horreeyey ay sameeyeen, oo dadka
Yahuudahna wuxuu ku dembaajiyey sanamyadiisii, **12** oo
sidaas daraaddeed Rabbiga ah Ilaaha reer binu Israa'iil
wuxuu leeyahay, Bal ogaada, belaayo weyn baan ku soo ridi
doonaa Yeruusaalem iyo dalka Yahuudahba, si ku alla kii
maqlaaba uu u argaggaxo. **13** Oo Yeruusaalem korkeeda
waxaan ku soo fidin doonaa xadhiggii Samaariya iyo xadhiggii
miisaanka lahaa ee gurigii Axaab; oo Yeruusaalem waxaan
u tirtiri doonaa siduu nin saxan u tirtiro oo kale, isagoo tirtira
oo gembiya. **14** Oo waan xoorayaa kuwa dhaxalkayga ka
hadha, oo waxaan u gacangelinayaa cadaawayaashooda,
oo iyana waxay cadaawayaashooda oo dhan u noqon
doonaan dhac iyo wax la boobo; **15** maxaa yeelay, wax
shar ah ayay hortayda ku samayn jireen oo way iga
xanaajin jireen tan iyo maalintii awowayaashood ay Masar
ka soo baxeen ilaa maantadan. **16** Oo weliba Manaseh
wuxuu daadiyey dhiig badan oo aan xaq qabin ilaa uu ka
buuxiyey Yeruusaalem dhinac ilaa dhinac, wuxuu kaloo
sameeyey dembigiisii uu dadka Yahuudah dembaajiyey,
markuu sameeyey wixii Rabbiga hortiisa sharka ku ahaa. **17**
Haddaba Manaseh falimihiisii kale iyo wixii uu sameeyey oo
dhan, iyo dembigiisii uu dembaabay oo dhammu sow kuma
qorna kitaabkii taariikhda boqorradii dalka Yahuudah? **18**
Kolkaasaa Manaseh dhintay oo la seexday awowayaashiis,
oo waxaa lagu aasay beertii gurigiisa, taasoo ahayd beertii
Cuusaah, oo meeshiisiina waxaa boqor ka noqday wiilkiisii
Aamoon. **19** Oo Aamoon markuu boqor noqday wuxuu
jiray laba iyo labaatan sannadood, oo laba sannadoodna
Yeruusaalem buu boqor ka ahaa, oo hooyadiis magaceedana
waxaa la odhan jiray Meshullemed ina Xaaruus oo reer
Yotbaah ahaa. **20** Oo isna wuxuu sameeyey wax shar ku
ah Rabbiga hortiisa, sidii aabbihiis Manaseh u yeelay oo
kale. **21** Oo wuxuu ku socday jidkii aabbihiis ku socday
oo dhan, oo wuxuu u adeegay sanamyadii aabbihiis u
adeegay oo dhan, wuuna caabuday. **22** Rabbiga ah Ilaahii
awowayaashiisna wuu ka tegey oo kuma uu socon jidkii
Rabbiga. **23** Markaasaa Aamoon addoommadiisii sirqooleen,
oo waxay boqorkii ku dhex dileen gurigiisii. **24** Laakiinse
dadkii dalka degganaa ayaa wada laayeen kuwii Boqor
Aamoon sirqooleen oo dhan, markaasaa dadkii dalku waxay
meeshiisii boqor ka dhigeen wiilkiisii Yoosiyaah. **25** Haddaba
Aamoon falimihiisii kale ee uu sameeyey sow kuma qorna
kitaabkii taariikhda boqorradii dalka Yahuudah? **26** Oo isagii
waxaa lagu aasay qabrigiisii ku dhex yiil beertii Cuusaah, oo
waxaa meeshiisii boqor ka noqday wiilkiisii Yoosiyaah.

**22** Yoosiyaah markuu boqor noqday wuxuu jiray siddeed
sannadood, oo Yeruusaalemna boqor buu ka ahaa kow
iyo soddon sannadood. Oo hooyadiis magaceeduna wuxuu
ahaa Yediidaah ina Cadaayaah oo reer Bosqad ahaa. **2** Oo
isagu wuxuu sameeyey wixii Rabbiga hortiisa ku qummanaa,
wuuna ku socday jidkii awowgiis Daa'uud maray oo dhan,
ugamana uu leexan xagga midigta iyo xagga bidixda toona.
**3** Oo Boqor Yoosiyaah sannaddiisii siddeed iyo tobnaad
wuxuu Shaafaan ina Asalyaah oo ahaa ina Meshullaam
oo karraanigii ahaa u diray gurigii Rabbiga, oo wuxuu ku
yidhi, **4** Orod oo waxaad u tagtaa Xilqiyaah oo ah wadaadka
sare, oo isagu ha xisaabo lacagta guriga Rabbiga la soo
geliyey oo irid-dhawrayaashu ay dadka ka soo ururiyeen.
**5** Oo iyagu ha u dhiibeen shaqaalaha guriga Rabbiga u
taliya, oo si meelaha guriga ka jajabay loo dhiso iyana ha u
dhiibeen shaqaalaha guriga Rabbiga ku jira, **6** kuwaasoo ah
nijaarrada, iyo waxdhisayaasha, iyo wastaadyada, oo ha ku
soo iibiyeen alwaax iyo dhagaxyo la qoray oo guriga lagu
dhiso. **7** Habase yeeshee lama xisaabin lacagtii iyaga loo
dhiibay, maxaa yeelay, waxay ahaayeen kuwa la aaminay.
**8** Markaasaa Xilqiyaah oo ahaa wadaadkii sare wuxuu ku
yidhi Shaafaan oo karraanigii ahaa, Waxaan guriga Rabbiga
ka dhex helay Kitaabkii Sharciga. Oo Xilqiyaah kitaabkii buu
u dhiibay Shaafaan, oo isna wuu akhriyey. **9** Markaasaa
Shaafaan oo karraanigii ahaa boqorkii u yimid, wuuna u
soo warramay oo ku yidhi, Addoommadaadii lacagtii guriga
Rabbiga laga dhex helay way soo ururiyeen, oo waxay
u dhiibeen shaqaalaha guriga Rabbiga u taliya. **10** Oo
Shaafaan oo karraanigii ahaa ayaa boqorkii u sheegay oo
ku yidhi, Wadaadkii Xilqiyaah ahaa wuxuu ii dhiibay kitaab.
Markaasaa Shaafaan kitaabkii ku akhriyey boqorka hortiisii.
**11** Oo markii boqorkii maqlay erayadii kitaabkii sharciga
ayuu dharkiisii jeexjeexay. **12** Markaasaa boqorkii amray
wadaadkii Xilqiyaah ahaa, iyo Axiiqaam ina Shaafaan, iyo
Cakhboor ina Miikaayaah, iyo Shaafaan oo ahaa karraanigii,
iyo Casaayaah oo ahaa midiidinkii boqorka, oo wuxuu ku
yidhi, **13** War taga oo aniga iyo dadka iyo reer Yahuudah oo
dhan Rabbiga inoo soo weyddiiya waxa ku saabsan erayada
kitaabkan la helay, waayo, cadhada Rabbiga oo uu inoo
cadhooday way weyn tahay, maxaa yeelay, awowayaasheen
ma ay dhegaysan erayada kitaabkan inay yeelaan kulli
waxyaalaha inagu saabsan ee ku qoran. **14** Markaasaa

wadaadkii Xilqiyaah ahaa, iyo Axiiqaam, iyo Cakhboor,
iyo Shaafaan, iyo Casaayaah waxay u tageen nebiyaddii
Xuldaah ahayd oo u dhaxday Shalluum ina Tiqwaah oo ahaa
ina Xarxas, kaasoo ahaa kii dharka dhawri jiray. (Haddaba
iyadu waxay degganayd Yeruusaalem xaafaddeeda labaad.)
Markaasay iyadii la hadleen, **15** oo waxay ku tidhi, Rabbiga
ah Ilaaha reer binu Israa'iil wuxuu leeyahay, Waxaad ninkii ii
soo kiin diray ku tidhaahdaan, **16** Rabbigu wuxuu leeyahay,
Bal eeg, belaayaan ku soo dejin doonaa meeshan iyo dadka
degganba, taasoo ah kulli erayadii ku yiil kitaabkii boqorka
dalka Yahuudah akhriyey oo dhan, **17** maxaa yeelay, iyagu
way iga tageen, oo waxay foox u shideen ilaahyo kale inay
igaga xanaajiyaan shuqulka gacmahooda oo dhan; oo sidaas
daraaddeed cadhadaydu waxay ku kululaanaysaa meeshan,
mana qaboobi doonto. **18** Laakiinse boqorkii dalka Yahuudah
oo idiin soo diray inaad Rabbiga wax soo weyddiisaan
waxaad ku tidhaahdaan, Rabbiga ah Ilaaha reer binu Israa'iil
wuxuu ka leeyahay waxa ku saabsan erayadii aad maqashay:
**19** Qalbigaagu wuu jilicsanaa oo Rabbiga hortiisa ayaad
isku hoosaysiisay markaad maqashay wixii aan kaga hadlay
meeshan iyo dadka degganba, iyo inay iyagu noqon doonaan
cidla iyo inkaar, oo waad igu hor ooyday, dharkaagiina
waad jeexjeexday, oo sidaas daraaddeed waan ku maqlay,
ayaa Rabbigu leeyahay. **20** Haddaba waxaan kula ururin
doonaa awowayaashaa, oo qabrigaaga nabad baad ugu
ururi doontaa, oo indhahaaguna ma ay arki doonaan kulli
belaayada aan meeshan ku soo dejin doono. Oo iyana
boqorkii ayay mar kale u war keeneen.

**23** Markaasaa boqorkii cid diray, oo waxaa loo soo ururiyey
odayaashii dalka Yahuudah iyo kuwii Yeruusaalem oo
dhan. **2** Oo boqorkiina wuxuu u kacay gurigii Rabbiga, oo
waxaa isagii la socday raggii dalka Yahuudah oo dhan, iyo
dadkii Yeruusaalem degganaa oo dhan, iyo wadaaddadii, iyo
nebiyadii, iyo dadkii oo dhan yar iyo weynba; oo isna wuxuu
hortooda ku akhriyey dhammaan erayadii kitaabkii axdiga
oo gurigii Rabbiga laga dhex helay. **3** Markaasaa boqorkii
istaagay tiirka agtiisii, oo wuxuu Rabbiga hortiisa axdi ugu
maray inuu Rabbiga raaco oo uu qalbigiisa oo dhan iyo
naftiisa oo dhan ku dhawro amarradiisa, iyo markhaatiyadiisa,
iyo qaynuunnadiisa, iyo inuu sii adkeeyo erayadii axdigan
oo kitaabkan ku qornaa, oo dadkii oo dhammuna axdigii
bay aqbaleen oo u istaageen. **4** Markaasaa boqorkii ku
amray wadaadkii sare oo ahaa Xilqiyaah, iyo wadaaddadii
lahaa derejada labaad, iyo iridjoogayaashii, inay macbudka
Rabbiga ka soo bixiyaan kulli weelashii loo sameeyey Bacal,
iyo geedihii Asheeraah, iyo ciidanka samada oo dhan; oo isna
wuxuu ku gubay Yeruusaalem dibaddeeda oo ah berrimmadii
Qidroon, oo dambaskoodiina Beytel buu u qaaday. **5** Oo
wuxuu casilay wadaaddadii sanamyada caabudi jiray oo ay
boqorradii dalka Yahuudah u doorteen inay foox ku shidaan
meelaha sarsare oo ku yaal magaalooyinka dalka Yahuudah
iyo meelaha ku wareegsan Yeruusaalem, iyo weliba kuwii
fooxa u shidi jiray Bacal, iyo qorraxda, iyo dayaxa, iyo
xiddigaha, iyo ciidanka samada oo dhan. **6** Oo geedihii
Asheeraahna gurigii Rabbiga wuu ka soo bixiyey oo wuxuu
geeyey Yeruusaalem dibaddeeda ilaa durdurka Qidroon, oo
wuxuu ku gubay durdurkii Qidroon agtiisa, oo intuu ku tuntay
ayuu budo ka dhigay, oo budadiina ku daadshay qabuurihii
dadka. **7** Oo wuxuu dumiyey guryihii makhnuudyada oo ku
dhex yiil guriga Rabbiga meeshay naaguhu ku samayn jireen
daahyadii geedihii Asheeraah. **8** Oo wadaaddadii oo dhanna
wuxuu ka soo kaxeeyey magaalooyinkii dalka Yahuudah,
wuuna nijaaseeyey meelihii sarsare oo wadaaddadu fooxa
ku shidi jireen, tan iyo Gebac ilaa Bi'ir Shebac; oo haddana
wuxuu dumiyey meelihii sarsare oo irdaha, kuwaas oo ku
yiil meesha laga soo galo iridda Yashuuca oo ahaa taliyihii
magaalada, oo ku yiil xagga bidix ee iridda magaalada.
**9** Habase yeeshee wadaaddadii meelaha sarsare ma ay
iman meeshii allabariga oo Rabbiga ee Yeruusaalem ku
tiil, laakiinse walaalahood way ku dhex cuni jireen kibis
aan khamiir lahayn. **10** Oo wuxuu nijaaseeyey Tofed oo
ku taal dooxadii reer Xinnom, si uusan ninna wiilkiisa ama
gabadhiisa dabkii u dhex marin Moleg. **11** Oo wuxuu fogeeyey
fardihii boqorradii dalka Yahuudah ay qorraxda ku siiyeen
iridda laga soo galo guriga Rabbiga ee u dhow qolkii Naataan
Meleg oo bohon ahaa uu degganaa, oo gaadhifardoodkii
qorraxdana buu gubay. **12** Oo meelihii allabariga oo ku
yiil qowladda sare ee Aaxaas saqafkeeda oo boqorradii
dalka Yahuudah ay sameeyeen, iyo meelihii allabariga oo
Manaseh ka sameeyey labada barxadood oo guriga Rabbiga
ayuu boqorkii wada dumiyey, oo halkaas intuu ka orday ayuu
boodhkoodii ku shubay durdurkii Qidroon. **13** Oo boqorkii
wuxuu kaloo nijaaseeyey meelihii sarsare oo Yeruusaalem
horteeda ku yiil, kuwaas oo ku yiil midigta buurta baabba'a,
kuwaas oo Sulaymaan oo ahaa boqorkii reer binu Israa'iil uu
u dhisay Cashtored oo ahayd karaahiyadii reer Siidoon, iyo
Kemoosh oo ahaa karaahiyadii reer Moo'aab, iyo Milkom oo
ahaa karaahiyadii reer Cammoon. **14** Oo wuxuu burburiyey
tiirarkii, geedihii Asheeraahna wuu jaray, oo meelahoodiina
wuxuu ka buuxiyey dad lafahood. **15** Oo weliba wuxuu kaloo
dumiyey meeshii allabariga ee Beytel ku tiil, iyo meeshii sare
oo Yaaraabcaam ina Nebaad oo dadkii Israa'iil dembaajiyey
uu sameeyey, oo isla meeshii sare wuu gubay oo intuu ku
tuntay ayuu budo ka dhigay, oo geedihii Asheeraahna wuu

gubay. 16 Oo Yoosiyaah markuu soo jeestay ayuu arkay
qabuurihii buurta ku yiil, oo intuu cid diray oo qabuurihii
lafihii ka soo bixiyey ayuu meeshii allabariga ku dul gubay,
wuuna nijaaseeyey, sidii uu ahaa erayga Rabbiga oo ninkii
Ilaah naadiyey, kaasoo ahaa kii waxyaalahan naadiyey. 17
Markaasuu yidhi, Taalladaas aan arkaa waa maxay? Oo
dadkii magaaladu waxay ku yidhaahdeen, Waa qabrigii ninkii
Ilaah oo dalka Yahuudah ka yimid oo naadiyey waxyaalahan
aad ku samaysay meeshii allabariga ee Beytel. 18 Markaasuu
yidhi, Iska daaya oo yaan ninna lafihiisa dhaqaajin. Sidaas
daraaddeed way iska daayeen lafihiisii iyo lafihii nebigii
Samaariya ka yimid. 19 Oo guryihii meelaha sarsare oo
dhan ee ku yiil magaalooyinka Samaariya ee ay boqorradii
dalka Israa'iil u dhiseen inay Rabbiga kaga xanaajiyaan ayuu
Yoosiyaah wada dumiyey, oo wuxuu ku sameeyey falimihii
uu Beytel ku sameeyey oo kale. 20 Oo wadaaddadii meelaha
sarsare oo halkaas joogay oo dhanna wuxuu ku wada
laayay meelihii allabariga dushooda, dushoodiina wuxuu ku
gubay lafo dad, dabadeedna Yeruusaalem buu ku noqday.
21 Markaasaa boqorkii dadkii oo dhan amray oo ku yidhi,
Rabbiga Ilaahiinna ah u dhawra Iidda Kormaridda, siday ugu
qoran tahay kitaabkan axdiga. 22 Hubaal Iiddaas Kormaridda
oo kale lama dhawrin tan iyo wakhtiyadii xaakinnadu reer
binu Israa'iil xukumi jireen, iyo wakhtiyadii boqorradii dalka
Israa'iil oo dhan, iyo wakhtiyadii boqorradii dalka Yahuudah
toona. 23 Laakiinse sannaddii siddeed iyo tobnaad oo Boqor
Yoosiyaah ayaa Iiddaas Kormaridda Rabbiga loogu dhawray
Yeruusaalem. 24 Oo weliba Yoosiyaah wuxuu baabbi'iyey
kuwii ruuxaanta lahaa, iyo saaxiriintii, iyo teraafiimtii, iyo
sanamyadii, iyo dhammaan karaahiyadii lagu arkay dalka
Yahuudah iyo Yeruusaalemba, si uu u adkeeyo erayadii
sharcigii ku qornaa kitaabkii wadaadkii Xilqiyaah ka dhex
helay gurigii Rabbiga. 25 Oo isaga hortiis ma jirin boqor
la mid ah oo Rabbiga ugu soo jeestay qalbigiisa oo dhan
iyo naftiisa oo dhan iyo xooggiisa oo dhan siduu ahaa
sharcigii Muuse oo dhan, oo isagii dabadiisna ma uu
kicin boqor la mid ahu. 26 Laakiinse Rabbigu kama uu
soo noqon cadhadiisii kululayd ee weynayd oo uu dadka
Yahuudah ugu cadhooday xanaaqii uu Manaseh isaga ka
xanaajiyey aawadiis. 27 Markaasaa Rabbigu yidhi, Anigu
dadkii Yahuudahna hortayda waan ka fogaynayaa, sidaan
dadkii Israa'iilba u fogeeyey oo kale, oo waan duminayaa
magaaladan aan doortay oo ah Yeruusaalem, iyo gurigii aan
idhi, Magacaygu halkaas ha yaallo. 28 Haddaba Yoosiyaah
falimihiisii kale iyo wixii uu sameeyey oo dhammu sow
kuma qorna kitaabkii taariikhda boqorradii dalka Yahuudah?
29 Oo isaga wakhtigiisii ayaa Fircoon Nekoo oo boqorka
Masar ahaa ku kacay boqorkii Ashuur ilaa Webi Yufraad, oo
waxaa isagii ku soo baxay Boqor Yoosiyaah, markaasaa
Fircoon Nekoo isagii ku dilay Megiddoo agteeda markuu
arkay. 30 Oo addoommadiisii intay gaadhifaras Megiddoo
kaga qaadeen isagoo meyd ah ayay Yeruusaalem keeneen
oo qabrigiisii ku aaseen. Markaasay dadkii waddanku soo
wateen Yehoo'aaxaas ina Yoosiyaah, oo intay subkeen ayay
boqor uga dhigeen meeshii aabbihiis. 31 Oo Yehoo'aaxaas
markuu boqor noqday wuxuu jiray saddex iyo labaatan
sannadood, oo intii saddex bilood ah ayuu Yeruusaalem
boqor ka ahaa; oo hooyadiis magaceeduna wuxuu ahaa
Xamuutal ina Yeremyaah, oo reer Libnaah ahayd. 32 Oo isna
wuxuu sameeyey wax Rabbiga hortiisa shar ku ah sidii wixii
ay awowayaashiis sameeyeen oo dhan. 33 Fircoon Nekoo
ayaa isagii ku xidhay Riblaah oo ku taal dalka Xamaad
si uusan Yeruusaalem boqor ugu sii ahaan; oo dalkiina
wuxuu saaray baad ah boqol talanti oo lacag ah iyo talanti
dahab ah. 34 Markaasaa Fircoon Nekoo ayaa Eliyaaqiim ina
Yoosiyaah boqor uga dhigay meeshii aabbihiis Yoosiyaah, oo
magiciisiina wuxuu u beddelay Yehooyaaqiim, laakiinse isagu
Yehoo'aaxaas buu kaxeeyey, oo markuu Masar keenay ayuu
halkaas ku dhintay. 35 Markaasaa Yehooyaaqiim lacagtii iyo
dahabkii Fircoon siiyey; laakiinse wuxuu cashuuray dalka
inuu lacagtii u bixiyo sidii Fircoon ugu amray; oo lacagtii iyo
dahabkii wuxuu ka soo guray dadkii dalka degganaa, intii mid
kastaba cashuurtiisu ahayd, si uu Fircoon Nekoo u siiyo. 36
Oo Yehooyaaqiimna markuu boqor noqday wuxuu jiray shan
iyo labaatan sannadood, oo Yeruusaalemna wuxuu boqor ka
ahaa kow iyo toban sannadood, oo hooyadiis magaceedana
waxaa la odhan jiray Sebuudaah ina Fedaayaah, oo reer
Ruumaah ahayd. 37 Oo isna wuxuu sameeyey wax shar ku
ah Rabbiga hortiisa, sidii wixii ay awowayaashiis sameeyeen
oo dhan.

24 Oo wakhtigiisii ayaa Nebukadnesar oo ahaa boqorkii
Baabuloon ku soo kacay, markaasaa Yehooyaaqiim
isagii addoon u noqday intii saddex sannadood ah,
dabadeedna wuu ka jeestay, oo ka fallaagoobay. 2 Markaasaa
Rabbigu u soo diray guutooyin reer Kaldayiin ah, iyo
guutooyin reer Suuriya ah, iyo guutooyin reer Moo'aab ah,
iyo guutooyin reer Cammoon ah, oo wuxuu iyaga u soo diray
inay dalka Yahuudah baabbi'iyaan sidii Rabbigu uga hadlay
nebiyadii addoommadiisa ahaa. 3 Hubaal amarkii Rabbiga
aawadiis ayaa tanu ugu soo degtay dadkii Yahuudah, inuu
iyaga ka dhaqaajiyo hortiisa dembigii Manaseh sameeyey
aawadiis, sidii ay ahaayeen kulli waxyaalihii uu sameeyey
oo dhan, 4 iyo dhiiggii aan xaq qabin oo uu daadshay,

waayo, Yeruusaalem wuxuu ku nijaaseeyey dhiig aan
xaq qabin; oo Rabbiguna ma uu cafiyeen. 5 Haddaba
Yehooyaaqiim falimihiisii kale iyo wixii uu sameeyey oo
dhammu sow kuma qorna kitaabkii taariikhda boqorradii
dalka Yahuudah? 6 Markaasaa Yehooyaaqiim dhintay oo
la seexday awowayaashiis, oo meeshiisiina waxaa boqor
ka noqday wiilkiisii Yehooyaakiin. 7 Oo boqorkii Masarna
mar dambe dalkiisii kama uu soo bixin, waayo, boqorkii
Baabuloon baa wada qaatay ilaa durdurkii Masar iyo tan iyo
Webi Yufraad ee uu dhammaan boqorka Masar lahaa. 8 Oo
Yehooyaakiinna markuu boqor noqday wuxuu jiray siddeed
iyo toban sannadood, wuxuuna Yeruusaalem boqor ka ahaa
intii saddex bilood ah; oo hooyadiis magaceedana waxaa la
odhan jiray Nexushtaa ina Elnaataan, oo reer Yeruusaalem
ahayd. 9 Oo isna wuxuu sameeyey wax Rabbiga hortiisa shar
ku ah sidii wixii uu aabbihiis sameeyey oo dhan. 10 Markaasaa
waxaa Yeruusaalem yimid oo magaaladii hareereeyey
addoommadii Nebukadnesar oo ahaa boqorkii Baabuloon.
11 Oo Nebukadnesar oo ahaa boqorkii Baabuloon ayaa soo
gaadhay magaaladii intay addoommadiisii hareera joogeen.
12 Markaasaa Yehooyaakiin oo ahaa boqorkii dalka Yahuudah
u soo baxay boqorkii Baabuloon, isagii, iyo hooyadiis,
iyo addoommadiisii, iyo amiirradiisii, iyo saraakiishiisiiba,
oo boqorkii Baabuloon ayaa isagii kaxeeyey sannaddii
siddeedaad oo boqornimadiisa. 13 Oo isna halkaasuu ka
qaatay khasnadihii guriga Rabbiga oo dhan iyo khasnadihii
guriga boqorka, oo wuxuu kala jejebiyey weelashii dahabka
ahaa oo boqorkii reer binu Israa'iil oo Sulaymaan ahaa uu ku
dhex sameeyey macbudkii Rabbiga, siduu Rabbigu yidhi. 14
Oo haddana wuxuu kaxaystay reer Yeruusaalem oo dhan,
iyo amiirradii oo dhan, iyo raggii xoog lahaa oo dhan, oo
wada ahaa toban kun oo maxaabiis ah, iyo saanacyadii
oo dhan, iyo tumaalladii, oo ninna ma hadhin dadkii dalka
ugu liitay mooyaane. 15 Oo wuxuu Baabuloon u kaxaystay
Yehooyaakiin; oo boqorka hooyadiis, iyo boqorka naagihiisii,
iyo saraakiishiisii, iyo raggii dalka madaxda u ahaa maxaabiis
ahaan ayuu Yeruusaalem uga kaxaystay oo Baabuloon la
tegey. 16 Oo boqorkii Baabuloon maxaabiis ahaan ayuu
Baabuloon u keenay raggii xoogga lahaa oo dhan oo
tiradoodu ahayd toddoba kun, iyo saanacyadii iyo tumaalladii
oo iyana kun ah, oo kulligood way wada xoog badnaayeen,
oo dagaalyahan bay ahaayeen. 17 Markaasaa boqorkii
Baabuloon wuxuu Yehooyaakiin meeshiisii boqor uga dhigay
adeerkiis Matanyaah oo magiciisiina wuxuu u beddelay
Sidqiyaah. 18 Oo Sidqiyaahna markuu boqor noqday wuxuu
jiray kow iyo labaatan sannadood, oo Yeruusaalemna wuxuu
boqor ka ahaa kow iyo toban sannadood, oo hooyadiis
magaceeduna wuxuu ahaa Xamuutal ina Yeremyaah oo reer
Libnaah ahayd. 19 Oo isna wuxuu sameeyey wax Rabbiga
hortiisa shar ku ah, sidii wixii Yehooyaaqiim sameeyey oo
dhan. 20 Oo tanu waxay Yeruusaalem iyo Yahuudah ugu
dhacday cadhadii Rabbiga aawadeed ilaa uu hortiisa iyaga
ka tuuray; kolkaasaa Sidqiyaah ka fallaagoobay boqorkii
Baabuloon.

**25** Oo sannaddii sagaalaad oo boqornimadiisa bishii
tobnaad maalinteedii tobnaad ayaa Nebukadnesar oo
ahaa boqorkii Baabuloon iyo ciidankiisii Yeruusaalem ku
kaceen, oo intay hor degeen ayay qalcado hareereheeda
ka dhisteen. 2 Oo sidaasay magaaladii u hareeraysnayd
tan iyo sannaddii kow iyo tobnaad oo Boqor Sidqiyaah.
3 Oo maalintii sagaalaad oo bishii afraad ayaa abaartii
magaaladii aad iyo aad ugu xumaatay, oo sidaas daraaddeed
dadkii dalka degganaa cunto ma haysan. 4 Markaasaa
meel magaalada ahayd la jebiyey, oo raggii dagaalka oo
dhammu intay habeennimo carareen ayay mareen jidkii
iriddii u dhexaysay labada derbi oo ku ag tiil beertii boqorka;
oo boqorkiina wuxuu maray jidkii Caraabaah. (Haddaba
reer Kaldayiin waxay ku wareegsanaayeen magaalada.) 5
Laakiinse ciidankii reer Kaldayiin ayaa boqorkii eryaday, oo
waxay ku gaadheen bannaannadii Yerixoo; oo ciidankiisii
oo dhammuna way ka kala firdheen. 6 Oo markaasay
boqorkii qabsadeen oo boqorkii Baabuloon ugu geeyeen
Riblaah, wayna xukumeen. 7 Oo Sidqiyaah wiilashiisiina
hortiisay ku laayeen, dabadeedna Sidqiyaah indhihii bay
ka soo bixiyeen, silsiladona bay ku xidheen, oo waxay
u kaxeeyeen Baabuloon. 8 Haddaba bishii shanaad,
maalinteedii toddobaad oo ahayd sannaddii sagaal iyo
tobnaad oo Nebukadnesar boqorkii Baabuloon ayaa waxaa
Yeruusaalem yimid Nebuusaradaan oo ahaa sirkaalkii askarta
oo ahaa addoonkii boqorkii Baabuloon. 9 Markaasuu gubay
gurigii Rabbiga iyo gurigii boqorka; oo wuxuu kaloo gubay
guryihii Yeruusaalem oo dhan, kuwaasoo ahaa guri kasta oo
weyn. 10 Markaasaa ciidankii reer Kaldayiin oo dhan oo la
socday sirkaalkii askarta waxay wada dumiyeen derbiyadii
Yeruusaalem ku wareegsanaa. 11 Oo Nebuusaradaan
wuxuu maxaabiis ahaan u kaxaystay dadkii magaalada ku
hadhay, iyo kuwii cararay oo u galay boqorkii Baabuloon,
iyo intii dadkii faraha badnaa ka hadhay. 12 Laakiinse
sirkaalkii askartu wuxuu ka tegey dadkii waddanka ugu
liitay inay ahaadaan kuwa canabka iyo beeraha kale ka
shaqeeya. 13 Markaasaa reer Kaldayiin jejebiyeen tiirarkii
naxaasta ahaa oo guriga Rabbiga ku jiray, iyo saldhigyadii
iyo berkeddii naxaasta ahayd oo guriga Rabbiga ku jiray,

oo naxaastoodiina waxay u qaadeen Baabuloon. **14** Oo
waxay kaloo qaadeen dheryihii, iyo majarafadihii, iyo alaabta
laambadaha lagu safayn jiray, iyo malgacadihii, iyo weelashii
naxaasta ahaa oo lagu adeegi jiray oo dhan. **15** Oo sirkaalkii
askartu wuxuu la tegey dabqaadayaashii, iyo maddiibadihii;
intii dahabka ahayd, dahab ahaan buu u qaaday, intii lacagta
ahaydna lacag ahaan. **16** Labadii tiir, iyo berkeddii, iyo
saldhigyadii uu Sulaymaan u sameeyey gurigii Rabbiga,
dhammaan weelashaas naxaastoodu miisaan ma lahayn. **17**
Oo tiirarka midkood sarajooggiisu wuxuu ahaa siddeed iyo
toban dhudhun, oo korkiisana waxaa sarnaa taaj naxaas ah;
oo taajka sarajooggiisuna wuxuu ahaa saddex dhudhun,
wuxuuna lahaa shabag iyo rummaanno taajka ku wareegsan,
oo kulligoodna waxay ahaayeen naxaas; tiirkii labaadna
waxan oo kaluu lahaa iyo shabag. **18** Oo sirkaalkii askartu
wuxuu kaloo kaxaystay Seraayaah oo ahaa wadaadkii sare,
iyo Sefanyaah oo ahaa wadaadkii labaad, iyo saddexdii
iridjoog; **19** oo wuxuu magaaladii kala soo baxay sirkaal
u sarreeyey raggii dagaalyahanka ahaa, iyo shan nin oo
ka mid ahaa kuwii boqorka hor joogi jiray oo magaaladii
laga dhex helay, iyo karraanigii sirkaalka ciidanka ee ururin
jiray dadkii waddanka, iyo lixdan nin oo ahaa dadkii dalka
degganaa oo magaaladii laga dhex helay. **20** Markaasaa
Nebuusaradaan oo ahaa sirkaalkii askartu iyagii kaxeeyey,
oo Riblaah ugu geeyey boqorkii Baabuloon. **21** Markaasaa
boqorkii Baabuloon iyagii ku laayay Riblaah oo ku taal dalka
Xamaad. Oo sidaasaa dadkii Yahuudah dalkoodii looga
kaxaystay iyagoo maxaabiis ah. **22** Oo dadkii dalka Yahuudah
lagaga tegey oo Nebukadnesar oo boqorkii Baabuloon ahaa
uu uga tegey, kuwaas wuxuu taliye uga dhigay Gedalyaah
ina Axiiqaam oo ahaa ina Shaafaan. **23** Haddaba saraakiishii
ciidammada oo dhammu iyaga iyo raggoodii markay maqleen
in boqorkii Baabuloon uu Gedalyaah ka dhigay taliye ayay
Gedalyaah ugu yimaadeen Misfaah, oo kuwaasu waxay
ahaayeen Ismaaciil ina Netanyaah, iyo Yooxaanaan ina
Qaaree'ax, iyo Seraayaah ina Tanhumed oo reer Netofaah
ahaa, iyo Ya'asanyaah oo uu dhalay kii reer Macakaad, iyagii
iyo raggoodiiba. **24** Markaasaa Gedalyaah u dhaartay iyagii
iyo raggoodiiba, oo ku yidhi, Ha ka cabsanina addoommada
reer Kaldayiin; haddaba dalka degganaada oo boqorka
Baabuloon u adeega, oo waad nabdoonaan doontaan. **25**
Laakiinse bishii toddobaad Ismaaciil ina Netanyaah oo ahaa
ina Eliishaamaac oo farcankii reer boqor ahaa ayaa yimid,
isagoo toban nin wata, markaasuu dilay Gedalyaah oo uu
dhintay, isaga iyo Yuhuuddii iyo reer Kaldayiin oo isaga
Misfaah la joogayba. **26** Markaasaa dadkii oo dhan yar iyo
weynba iyo saraakiishii ciidammada way kaceen oo waxay
tageen Masar, waayo, waxay ka cabsadeen reer Kaldayiin.
**27** Oo sannaddii toddoba iyo soddonaad intii boqorkii dalkii
Yahuudah oo Yehooyaakiin ahaa uu xidhnaa, bishii laba
iyo tobnaad, maalinteedii toddoba iyo labaatanaad, Ewiil
Merodag oo ahaa boqorkii Baabuloon sannaddii uu boqor
noqday ayuu xabsigii ka soo bixiyey Yehooyaakiin oo ahaa
boqorkii dalka Yahuudah. **28** Oo si roon buu ula hadlay, oo
wuxuu carshigiisii ka kor mariyey carshiyadii boqorradii isagii
Baabuloon la joogay. **29** Oo dharkiisii xabsiga ayuu beddelay
oo hortiisuu wax ku cuni jiray had iyo jeerba cimrigiisii oo
dhanba. **30** Oo xagga masruufkiisana boqorka xaggiisa
waxaa laga siin jiray masruuf joogta ah, oo maalin kasta
qayb buu heli jiray cimrigiisii oo dhan.

# Taariikhdii Kowaad

1 Aadan, Seed, Enoos, 2 Qiinaan, Mahalaleel, Yaared, 3
Enoog, Metushelax, Lameg, 4 Nuux, Sheem, Xaam, iyo.
5 Wiilashii Yaafed waxay ahaayeen Gomer, iyo Maajuuj, iyo
Maaday, iyo Yaawaan, iyo Tubal, iyo Mesheg, iyo Tiiraas. 6
Wiilashii Gomerna waxay ahaayeen Ashkenas, iyo Diifad,
iyo Togarmaah. 7 Wiilashii Yaawaanna waxay ahaayeen
Eliishaah, iyo Tarshiish, iyo Kitiim, iyo Rodaaniim. 8 Wiilashii
Xaamna waxay ahaayeen Kuush, iyo Misrayim, iyo Fuud iyo
Kancaan. 9 Wiilashii Kuushna waxay ahaayeen Sebaa, iyo
Xawiilaah, iyo Sabtaa, iyo Racmaah, iyo Sabteka. Wiilashii
Racmaahna waxay ahaayeen Shebaa iyo Dedaan. 10
Kuushna wuxuu dhalay Nimrod, wuxuuna noqday mid dhulka
xoog weyn ku leh. 11 Misrayimna wuxuu dhalay Luudiim, iyo
Canaamiim, iyo Lehaabiim, iyo Naftuxiim, 12 iyo Fatrusiim, iyo
Kasluxiim oo ay reer Falastiin ka soo farcamay, iyo Kaftoriim.
13 Kancaanna wuxuu dhalay Siidoon oo curadkiisii ahaa, iyo
Xeed, 14 iyo reer Yebuus, iyo reer Amor, iyo reer Girgaash, 15
iyo reer Xiwi, iyo reer Carqi, iyo reer Siini, 16 iyo reer Arwaad,
iyo reer Semaar, iyo reer Xamaad. 17 Wiilashii Sheemna
waxay ahaayeen Ceelaam, iyo Ashuur, iyo Arfaksad, iyo
Luud, iyo Araam, iyo Cuus, iyo Xuul, iyo Geter, iyo Mesheg.
18 Oo Arfaksad wuxuu dhalay Sheelaah, Sheelaahna wuxuu
dhalay Ceeber. 19 Oo Ceeberna waxaa u dhashay laba
wiil, mid magiciisu wuxuu ahaa Feleg, waayo, waagiisii
ayaa dhulku qaybsamay, magaca walaalkiisna wuxuu ahaa
Yoqtaan. 20 Yoqtaanna wuxuu dhalay Almoodaad, iyo Shelef,
iyo Xasarmaawed, iyo Yerah, 21 iyo Hadooraam, iyo Uusaal,
iyo Diqlah, 22 iyo Ceebaal, iyo Abiimaa'el, iyo Shebaa, 23
iyo Oofir, iyo Xawiilaah, iyo Yoobaab. Kuwaasu kulli waxay
ahaayeen wiilashii Yoqtaan. 24 Sheem, Arfaksad, Sheelaah,
25 Ceeber, Feleg, Recu, 26 Seruug, Naaxoor, Terax, 27
Aabraam (kaasoo ah Ibraahim). 28 Wiilashii Ibraahimna
waxay ahaayeen Isxaaq iyo Ismaaciil. 29 Oo intanu waa
qarniyadoodii, Ismaaciil curadkiisii wuxuu ahaa, Nebayod,
dabadeedna wuxuu dhalay Qedaar, iyo Adbe'el, iyo Mibsam,
30 iyo Mishmaac, iyo Duumah, iyo Masa, 31 iyo Hadad, iyo
Teemaa, iyo Yetuur, iyo Naafiish, iyo Qedemah. Kuwanu waa
wiilashii Ismaaciil. 32 Oo kuwanuna waa wiilashii Qetuurah,
taas oo ahayd Ibraahim naagtiisii addoonta ahayd. Iyadu
waxay dhashay Simraan, iyo Yoqshaan, iyo Medaan, iyo
Midyaan, iyo Yishbaaq, iyo Shuu'ah. Yoqshaan wiilashiisiina
waxay ahaayeen Shebaa iyo Dedaan. 33 Wiilashii Midyaanna
waxay ahaayeen Ceefah, iyo Ceefer, iyo Xanoog, iyo Abiidac,
iyo Eldacah. Kuwanu waxay wada ahaayeen Qetuurah
wiilasheedii. 34 Ibraahimna wuxuu dhalay Isxaaq. Wiilashii
Isxaaqna waxay ahaayeen Ceesaw iyo Israa'iil. 35 Wiilashii
Ceesawna waxay ahaayeen Eliifas, iyo Recuu'eel, iyo
Yecuush, iyo Yaclaam, iyo Qorax. 36 Wiilashii Eliifasna waxay
ahaayeen Teemaan, iyo Oomaar, iyo Sefii, iyo Gactaam, iyo
Qenas, iyo Timnac, iyo Camaaleq. 37 Wiilashii Recuu'eelna
waxay ahaayeen Nahad, iyo Serax, iyo Shammah, iyo
Misaah. 38 Wiilashii Seciirna waxay ahaayeen Lootaan, iyo
Shoobaal, iyo Sibecoon, iyo Canah, iyo Dishon, iyo Eeser, iyo
Diishaan. 39 Wiilashii Lootaanna waxay ahaayeen Xori iyo
Hoomaam, oo Timnacna waxay ahayd Lootaan walaashiis.
40 Wiilashii Shoobaalna waxay ahaayeen Calyaan, iyo
Maanahad, iyo Ceebaal, iyo Shefii, iyo Oonaam. Wiilashii
Sibecoonna waxay ahaayeen Ayah, iyo Canah. 41 Wiilashii
Canahna waxay ahaayeen Dishon. Wiilashii Dishonna waxay
ahaayeen Xamraan, iyo Eshbaan, iyo Yitraan, iyo Keraan. 42
Wiilashii Eeserna waxay ahaayeen Bilhaan, iyo Sacwaan, iyo
Yacaqaan. Wiilashii Diishaanna waxay ahaayeen Cuus iyo
Araan. 43 Haddaba kuwanu waa boqorradii u talin jiray dalka
reer Edom, intaan boqorna u talin reer binu Israa'iil, Belac ina
Becoor, oo magaaladiisana magaceeda waxaa la odhan jiray
Dinhaabah. 44 Markaasaa Belac dhintay oo waxaa meeshiisii
boqor ka noqday Yoobaab ina Serax oo reer Bosraah ahaa.
45 Markaasaa Yoobaab dhintay, oo waxaa meeshiisii boqor
ka noqday Xushaam oo ka yimid dalka reer Teemaan. 46
Markaasaa Xushaam dhintay, oo waxaa meeshiisii boqor
ka noqday Hadad ina Bedad, kaasoo Midyaan ku dilay
beertii Moo'aab dhexdeeda, oo magaaladiisa magaceedana
waxaa la odhan jiray Cawiid. 47 Markaasaa Hadad dhintay,
oo waxaa meeshiisii boqor ka noqday Samlah oo ahaa
reer Masreqah. 48 Markaasaa Samlah dhintay, oo waxaa
meeshiisii boqor ka noqday Shaa'uul oo ka yimid Rexobod oo
Webiga ku ag tiil. 49 Markaasaa Shaa'uul dhintay, oo waxaa
meeshiisii boqor ka noqday Bacal Xaanaan ina Caqboor. 50
Markaasaa Bacal Xaanaan dhintay, oo waxaa meeshiisii
boqor ka noqday Hadad, oo isna magaaladiisu waxay ahayd
Faacuu, oo naagtiisa magaceedana waxaa la odhan jiray
Meheetabeel oo ay dhashay Matreed, iyana waxay ahayd
ina Meesaahaab. 51 Hadadna wuu dhintay. Oo ugaasyadii
reer Edomna waxay ahaayeen ugaas Timnac, iyo ugaas
Calwah, iyo ugaas Yeteed, 52 iyo ugaas Aaholiibaamah, iyo
ugaas Eelaah, iyo ugaas Fiinon, 53 iyo ugaas Qenas, iyo
ugaas Teemaan, iyo ugaas Mibsaar, 54 iyo ugaas Magdii'eel,
iyo ugaas Ciiraam. Intaasu waa ugaasyadii reer Edom.

2 Kuwanu waa Israa'iil wiilashiisii, oo waxay ahaayeen
Ruubeen, iyo Simecoon, iyo Laawi, iyo Yahuudah, iyo
Isaakaar, iyo Sebulun, 2 iyo Daan, iyo Yuusuf, iyo Benyaamiin,

iyo Naftaali, iyo Gaad, iyo Aasheer. **3** Wiilashii Yahuudahna
waxay ahaayeen Ceer, iyo Oonaan, iyo Sheelaah, oo
saddexdaas waxaa isaga u dhashay Batshuuca oo reer
Kancaan ahayd. Oo Ceer oo ahaa curadkii Yahuudah wuxuu
ahaa mid Rabbiga hortiisa shar ku ah, oo isna Rabbigu
wuu dilay. **4** Oo Taamaar oo uu soddog u ahaa ayaa
isaga u dhashay Feres iyo Serax. Wiilashii Yahuudah oo
dhammuna waxay ahaayeen shan. **5** Wiilashii Feresna
waxay ahaayeen Xesroon, iyo Xaamuul. **6** Wiilashii Seraxna
waxay ahaayeen Simrii, iyo Eetaan, iyo Heemaan, iyo
Kalkol, iyo Daarac, oo dhammaantoodna waxay ahaayeen
shan. **7** Ina Karmiina wuxuu ahaa Caakaar oo ahaa kii
reer binu Israa'iil dhibay, oo ku xadgudbay alaabtii la
xaaraameeyey. **8** Ina Eetaanna wuxuu ahaa Casaryaah. **9**
Oo weliba Xesroon wiilashiisii u dhashay waxay ahaayeen
Yeraxme'eel, iyo Raam, iyo Keluubay. **10** Oo Raam wuxuu
dhalay Cammiinaadaab, Cammiinaadaabna wuxuu dhalay
Naxshoon, oo reer Yahuudah amiir u ahaan jiray. **11** Oo
Naxshoon wuxuu dhalay Salmaa, Salmaana wuxuu dhalay
Bocas, **12** Bocasna wuxuu dhalay Coobeed, Coobeedna
wuxuu dhalay Yesay, **13** Yesayna wuxuu dhalay curadkiisii
oo ahaa Elii'aab, iyo Abiinaadaab oo ahaa wiilkiisii labaad,
iyo Shimcaa oo ahaa wiilkiisii saddexaad, **14** iyo Netaneel oo
ahaa kii afraad, iyo Radday oo ahaa kii shanaad, **15** iyo
Osem oo ahaa kii lixaad, iyo Daa'uud oo ahaa kii toddobaad,
**16** oo walaalahoodii gabdhaha ahaana waxay ahaayeen
Seruuyaah iyo Abiigayil, oo Seruuyaah wiilasheediina waxay
ahaayeen saddex, Abishay iyo Yoo'aab iyo Casaaheel.
**17** Abiigayilna waxay dhashay Camaasaa, oo Camaasaa
aabbihiisna wuxuu ahaa Yeter oo reer Ismaaciil ahaa. **18**
Kaaleeb ina Xesroonna wuxuu carruur ka dhalay naagtiisii
Casuubaah, iyo Yeriicood, oo kuwanuna waxay ahaayeen
wiilasheedii, waana Yeesher, iyo Shoobaab, iyo Ardoon.
**19** Oo Casuubaahna way dhimatay, oo Kaaleeb wuxuu
guursaday Efraad, oo iyana isagay u dhashay Xuur. **20**
Xuurna wuxuu dhalay Uurii, Uuriina wuxuu dhalay Besaleel.
**21** Oo taas dabadeedna Xesroon wuxuu u tegey inantii Maakiir
oo ahaa Gilecaad aabbihiis, oo taas wuxuu guursaday
isagoo lixdan sannadood jira, oo waxayna isaga u dhashay
Seguub. **22** Seguubna wuxuu dhalay Yaa'iir, oo dalka reer
Gilecaad ku lahaa saddex iyo labaatan magaalo. **23** Oo
Geshuur iyo Araam ayaa waxay qaateen magaalooyinkii
reer Yaa'iir, iyo Qenaad, iyo tuulooyinkeedii, waxayna wada
ahaayeen lixdan magaalo. Oo kulli intaasu waxay wada
ahaayeen wiilashii Maakiir oo ahaa Gilecaad aabbihiis. **24**
Oo Xesroon markuu Kaaleeb Efraataah ku dhintay dabadeed
ayaa Abiiyaah oo ahayd Xesroon naagtiisii waxay isagii
u dhashay Ashxuur oo ahaa Teqooca aabbihiis. **25** Oo
Yeraxme'eel oo ahaa curadkii Xesroon wiilashiisiina waxay
ahaayeen Raam oo curadkiisii ahaa, iyo Buunaah, iyo Oren,
iyo Osem, iyo Axiiyaah. **26** Oo Yeraxme'eelna wuxuu qabay
naag kale, oo magaceeda la odhan jiray Cataaraah, oo iyana
waxay ahayd Oonaam hooyadiis. **27** Oo Raam oo ahaa
curadkii Yeraxme'eel wiilashiisii waxay ahaayeen Macas,
iyo Yaamiin, iyo Ceeqer. **28** Wiilashii Oonaamna waxay
ahaayeen Shammay, iyo Yaadaac, wiilashii Shammayna
waxay ahaayeen Naadaab iyo Abiishuur. **29** Oo naagtii
Abiishuur magaceedana waxaa la odhan jiray Abiixayil, iyana
waxay isagii u dhashay Axbaan iyo Mooliid. **30** Wiilashii
Naadaabna waxay ahaayeen Seled, iyo Afayim, laakiinse
Seled wiilalla'aan buu ku dhintay. **31** Ina Afayimna wuxuu
ahaa Yishcii. Ina Yishciina wuxuu ahaa Sheeshaan. Ina
Sheeshaanna wuxuu ahaa Axlay. **32** Shammay walaalkiisii
oo Yaadaac ahaa wiilashiisiina waxay ahaayeen Yeter,
iyo Yoonaataan, Yeterna wiilalla'aan buu ku dhintay. **33**
Wiilashii Yoonaataanna waxay ahaayeen Feled, iyo Saasaa.
Kuwaasu waxay wada ahaayeen wiilashii Yeraxme'eel. **34**
Haddaba Sheeshaan wiilal ma lahayn, gabdho mooyaane.
Oo Sheeshaan wuxuu lahaa addoon Masri ah, oo magiciisana
waxaa la odhan jiray Yarxaac. **35** Markaasaa Sheeshaan
gabadhiisii u guuriyey addoonkiisii Yarxaac la odhan jiray,
oo iyana waxay isagii u dhashay Catay. **36** Catayna wuxuu
dhalay Naataan, Naataanna wuxuu dhalay Saabaad, **37**
Saabaadna wuxuu dhalay Eflaal, Eflaalna wuxuu dhalay
Coobeed, **38** Coobeedna wuxuu dhalay Yeehuu, Yeehuuna
wuxuu dhalay Casaryaah, **39** Casaryaahna wuxuu dhalay
Xeles, Xelesna wuxuu dhalay Elecaasaah, **40** Elecaasaahna
wuxuu dhalay Sismay, Sismayna wuxuu dhalay Shalluum, **41**
Shalluumna wuxuu dhalay Yeqamyaah, Yeqamyaahna wuxuu
dhalay Eliishaamaac. **42** Yeraxme'eel walaalkiis Kaaleeb
wiilashiisiina waxay ahaayeen curadkiisii Meeshaac, oo Siif
aabbihiis ahaa, iyo wiilashii Maareeshaah oo ahaa Xebroon
aabbihiis. **43** Wiilashii Xebroonna waxay ahaayeen Qorax,
iyo Tafuu'ax, iyo Reqem, iyo Shemac. **44** Shemacna wuxuu
dhalay Raxam, oo ahaa Yorqecaam aabbihiis, Reqemna
wuxuu dhalay Shammay. **45** Shammay wiilkiisiina wuxuu
ahaa Maacoon, Maacoonna wuxuu ahaa Beytsuur aabbihiis.
**46** Ceefah oo ahayd Kaaleeb naagtiisii addoonta ahaydna
waxay dhashay Xaaraan, iyo Moosaa, iyo Gaasees, oo
Xaaraanna wuxuu dhalay Gaasees. **47** Wiilashii Yaahdayna
waxay ahaayeen Regem, iyo Yootam, iyo Geeshaan, iyo
Feled, iyo Ceefah, iyo Shacaf. **48** Macakaah oo ahayd
Kaaleeb naagtiisii addoonta ahaydna waxay dhashay Sheber
iyo Tirxanaah. **49** Oo waxay kaloo dhashay Shacaf oo ahaa

Madmannaah aabbihiis, iyo Shewaa oo ahaa Makbeenaa
aabbihiis, iyo Gibecaa aabbihiis, oo Kaaleeb gabadhiisana
waxaa la odhan jiray Caksaah. 50 Oo kuwanu waxay wada
ahaayeen ilmaha Kaaleeb, kaasoo ahaa ina Xuur, oo ahaa
curadkii Efraataah, iyo Shoobaal oo ahaa Qiryad Yecaariim
aabbihiis, 51 iyo Salmaa oo ahaa Beytlaxam aabbihiis,
iyo Xaareef oo ahaa Beytgaadeer aabbihiis. 52 Shoobaal
oo ahaa Qiryad Yecaariim aabbihiisna wuxuu lahaa wiilal,
Haaro'eh iyo reer Menuxood badhkiis. 53 Oo reer Qiryad
Yecaariim qolooyinkoodiina waxay ahaayeen reer Yeter, iyo
reer Fuutii, iyo reer Shumaatii, iyo reer Mishraacii, oo kuwaas
waxaa ka soo farcamay reer Sorcaah, iyo reer Eshtaa'ool.
54 Wiilashii Salmaana waxay ahaayeen Beytlaxam, iyo reer
Netofaah, iyo Cataarood Beytyoo'aab, iyo reer Maanahad
badhkiis, iyo reer Sorcii. 55 Oo karraaniyadii Yacbees
degganaa qolooyinkoodiina waxay ahaayeen reer Tircaatii,
iyo reer Shimcaatiim, iyo reer Suukaatiim. Intaasu waa reer
Qeynkii ka soo farcamay Xammad oo ahaa reer Reekaab
aabbahood.

3 Haddaba kuwanu waxay ahaayeen wiilashii Daa'uud,
oo isaga ugu dhashay Xebroon, oo curadkiisu wuxuu
ahaa Amnoon, oo ay dhashay Axiinocam tii reer Yesreceel,
oo kii labaadna wuxuu ahaa Daanyeel, oo ay dhashay
Abiigayil tii reer Karmel, 2 oo kii saddexaadna wuxuu
ahaa Absaaloom oo ay dhashay Macakaah oo ahayd
boqorkii Geshuur oo Talmay ahaa gabadhiisii, oo kii afraadna
wuxuu ahaa Adoniiyaah oo ay Haggiid dhashay, 3 kii
shanaadna wuxuu ahaa Shefatyaah oo ay Abiital dhashay,
kii lixaadna, wuxuu ahaa Yitrecaam oo uu ka dhalay naagtiisii
Ceglaah. 4 Lix waxay ugu dhasheen Xebroon, oo Xebroon
wuxuu boqor ka ahaa toddoba sannadood iyo lix bilood, oo
Yeruusaalemna wuxuu boqor ku ahaa saddex iyo soddon
sannadood. 5 Oo kuwanuna waxay isaga ugu dhasheen
Yeruusaalem: Shimcaa, iyo Shoobaab, iyo Naataan, iyo
Sulaymaan, afartaas oo ay dhashay Batshuuca oo ahayd
ina Cammii'eel, 6 iyo Yibxaar, iyo Eliishaamaac, iyo Eliifeled,
7 iyo Nogah, iyo Nefeg, iyo Yaafiica, 8 iyo Eliishaamaac, iyo
Elyaadaac, iyo Eliifeled, oo iyana waxay ahaayeen sagaal. 9
Oo kuwaas oo dhammu waxay ahaayeen ilmaha Daa'uud,
oo wiilashiisii uu addoommaha ka dhalayna kuma ay jirin, oo
Taamaarna waxay ahayd walaashood. 10 Oo Sulaymaan
wiilkiisiina wuxuu ahaa Rexabcaam, Rexabcaam wiilkiisiina
wuxuu ahaa Abiiyaah, Abiiyaah wiilkiisiina wuxuu ahaa
Aasaa, wiilkiisiina wuxuu ahaa Yehooshaafaad, 11 wiilkiisiina
wuxuu ahaa Yooraam, wiilkiisiina wuxuu ahaa Axasyaah,
wiilkiisiina wuxuu ahaa Yoo'aash, 12 wiilkiisiina wuxuu ahaa
Amasyaah, wiilkiisiina wuxuu ahaa Casaryaah, wiilkiisiina
wuxuu ahaa Yootam, 13 wiilkiisiina wuxuu ahaa Aaxaas,
wiilkiisiina wuxuu ahaa Xisqiyaah, wiilkiisiina wuxuu ahaa
Manaseh, 14 wiilkiisiina wuxuu ahaa Aamoon, wiilkiisiina
wuxuu ahaa Yoosiyaah. 15 Wiilashii Yoosiyaahna waa kuwan:
curadkiisii Yooxaanaan, kii labaadna Yehooyaaqiim, kii
saddexaadna Sidqiyaah, kii afraadna Shalluum. 16 Wiilashii
Yehooyaaqiimna waxay ahaayeen: wiilkiisii Yekonyaah, iyo
wiilkiisii Sidqiyaah. 17 Oo maxbuuskii Yekonyaah ahaa
wiilashiisii waxay ahaayeen: 18 wiilkiisii Salaatii'eel, iyo
Malkiiraam, iyo Fedaayaah, iyo Shen'asar, iyo Yeqamyaah,
iyo Hooshaamaac, iyo Nedabyaah. 19 Wiilashii Fedaayaahna
waxay ahaayeen Serubaabel, iyo Shimcii, oo wiilashii
Serubaabelna waxay ahaayeen Meshullaam, iyo Xananyaah,
oo Shelomiidna waxay ahayd walaashood, 20 iyo Xashubaah,
iyo Ohel, iyo Berekyaah, iyo Xasadyaah, iyo Yuushabxesed,
oo iyana waxay ahaayeen shan. 21 Wiilashii Xananyaahna
waxay ahaayeen Felatyaah, iyo Yeshaacyaah, oo waxaa
kaloo jiray wiilashii Refaayaah, iyo wiilashii Arnaan, iyo
wiilashii Cobadyaah, iyo wiilashii Shekaanyaah. 22 Wiilashii
Shekaanyaahna waxay ahaayeen Shemacyaah, wiilashii
Shemacyaahna waxay ahaayeen Xatuush, iyo Yigaal, iyo
Baarii'ax, iyo Necaryaah, iyo Shaafaad, oo waxay ahaayeen
lix. 23 Wiilashii Necaryaahna waxay ahaayeen Eliyooceenay,
iyo Xisqiyaah, iyo Casriiqaam, oo waxay ahaayeen saddex.
24 Wiilashii Eliyooceenayna waxay ahaayeen, Hoodawyaah,
iyo Eliyaashiib, iyo Felaayaah, iyo Caquub, iyo Yooxaanaan,
iyo Delaayaah, iyo Canaanii, waxayna ahaayeen toddoba.

4 Wiilashii Yahuudahna waxay ahaayeen Feres, iyo
Xesroon, iyo Karmii, iyo Xuur, iyo Shoobaal. 2 Oo
Re'aayaah oo ahaa ina Shoobaalna wuxuu dhalay Yaaxad,
Yaaxadna wuxuu dhalay Axuumay iyo Lahad. Kuwanu waa
qolooyinkii reer Sorcaah. 3 Oo kuwanuna waxay ahaayeen
wiilashii uu dhalay Ceetaam aabbihiis, oo waa Yesreceel,
iyo Yishmaa, iyo Yidbaash, oo walaashood magaceedana
waxaa la odhan jiray Haselelfoonii, 4 iyo Fenuu'eel oo
ahaa Gedoor aabbihiis, iyo Ceser oo ahaa Xuushaah
aabbihiis. Kuwanu waa wiilashii Xuur, kaasoo ahaa curadkii
Efraataah, oo ahaa Beytlaxam aabbihiis. 5 Oo Ashxuur oo
ahaa Teqooca aabbihiisna wuxuu qabay laba naagood, oo
waxay ahaayeen Xelaah iyo Nacaraah. 6 Oo Nacaraah
waxay isagii u dhashay Axuusaam, iyo Heefer, iyo Teemnii,
iyo Haa'axashtaarii. Intaasu waxay ahaayeen Nacaraah
wiilasheedii. 7 Xelaah wiilasheediina waxay ahaayeen Sered,
iyo Isehaar, iyo Etnaan. 8 Haqoosna wuxuu dhalay Caanuub,
iyo Sobeebaah, iyo qolooyinka reer Axarxeel oo ahaa ina
Haaruum. 9 Yacbeesna wuu ka ciso badnaa walaalihiis oo

dhan, oo hooyadiis ayaa isagii ku magacawday Yacbees, oo
waxay tidhi, Maxaa yeelay, isaga waxaan ku dhalay tiiraanyo.
10 Oo Yacbeesna wuxuu baryay Ilaahii reer binu Israa'iil,
oo ku yidhi, Waxaan jeclaan lahaa inaad i barakaysid, oo
aad soohdintayda ii ballaadhisid, iyo in gacantaadu ila jirto,
oo aad sharka iga dhawrtid, si aanan u tiiraanyoon! Oo
Ilaahna wuu siiyey wixii uu weyddiistay. 11 Keluub oo ahaa
Shuuxah walaalkiisna wuxuu dhalay Mexiir, oo ahaa Eshtoon
aabbihiis. 12 Eshtoonna wuxuu dhalay Beytraafaa, iyo
Faasee'ax, iyo Texinnaah oo ahaa Ciirnaaxaash aabbihiis.
Oo kuwanu waa nimankii Reekaah. 13 Wiilashii Qenasna
waxay ahaayeen, Cotnii'eel, iyo Seraayaah, oo Cotnii'eelna
wuxuu dhalay Xatad. 14 Mecoonotayna wuxuu dhalay
Cofraah, oo Seraayaahna wuxuu dhalay Yoo'aab oo ahaa
Geharashiim aabbihiis, waayo, iyagu waxay ahaayeen rag
saaniciin ah. 15 Kaaleeb ina Yefunneh wiilashiisiina waxay
ahaayeen Iiruu, iyo Eelaah, iyo Nacam, ina Eelaahna wuxuu
ahaa Qenas. 16 Wiilashii Yehaleleelna waxay ahaayeen Siif
iyo Siifaah, iyo Tiiryaa, iyo Asareel. 17 Ilmaha Cesraahna
waxay ahaayeen Yeter, iyo Mered, iyo Ceefer, iyo Yaaloon,
oo iyana waxay dhashay Maryan, iyo Shammay, iyo Yishbax
oo ahaa Eshtemooca aabbihiis. 18 Naagtiisii Yahuudiyadda
ahaydna waxay dhashay Yered oo ahaa Gedoor aabbihiis,
iyo Xeber oo ahaa Sookoo aabbihiis, iyo Yequutii'eel oo ahaa
Saanoo'ax aabbihiis. Oo kuwanuna waa wiilashii Bityaah oo
ahayd ina Fircoon oo uu Mered guursaday. 19 Oo Hoodiyaah
naagtiisii oo ahayd Naxam walaashiis wiilasheediina waxay
ahaayeen Qeciilaah kii reer Garmii aabbihiis, iyo Eshtemooca
oo ahaa reer Macakaad. 20 Wiilashii Shiimoonna waxay
ahaayeen Cammoon, iyo Rinnaah, iyo Benxaanaan, iyo
Tiiloon. Wiilashii Yishciina waxay ahaayeen Sooxeed iyo
Bensooxeed. 21 Sheelaah ina Yahuudah wiilashiisiina waxay
ahaayeen Ceer oo ahaa Leekaah aabbihiis, iyo Lacadaah
oo ahaa Maareeshaah aabbihiis, iyo qolooyinka reerka
kuwa dhar wanaagsan samayn jiray oo ka soo farcamay
reer Ashbeeca, 22 iyo Yooqiim, iyo dadka reer Kosebaa,
iyo Yoo'aash, iyo Saaraaf oo u talin jiray Moo'aab, iyo
Yaashubilexem. Oo taariikhduna waa wax aad u gaboobay.
23 Oo kuwanuna waxay ahaayeen dheryodhoobyadii, oo
waxay degganaan jireen Netaa'iim iyo Gedeeraah, oo
halkaas ayay la degganaan jireen boqorka si ay shuqulkiisa
u sameeyaan. 24 Wiilashii Simecoonna waxay ahaayeen
Nemuu'eel, iyo Yaamiin, iyo Yaariib, iyo Serax, iyo Shaa'uul
25 oo dhalay Shalluum, oo isna dhalay Mibsam, oo isna
dhalay Mishmaac. 26 Mishmaac farcankiisuna wuxuu ahaa
Xamuu'eel oo dhalay Sakuur, oo isna dhalay Shimcii. 27
Shimciina wuxuu lahaa lix iyo toban wiil iyo lix gabdhood,
laakiinse walaalihiis carruur badan ma ay lahayn, oo
qoladooda oo dhammuna uma ay tarmin, sida reer Yahuudah
oo kale. 28 Oo iyagu waxay degganaayeen Bi'ir Shebac, iyo
Molaadaah, iyo Xasar Shuucaal, 29 iyo Bilhah, iyo Cesem,
iyo Toolad, 30 iyo Betuu'eel, iyo Xormaah, iyo Siiqlag, 31
iyo Beytmarkabood, iyo Xasar Suusiim, iyo Beytbirii, iyo
Shacarayim. Intaasu waxay ahaayeen magaalooyinkoodii
ay degganaayeen tan iyo waagii Daa'uud boqortooyada
haystay. 32 Oo tuulooyinkoodiina waxay ahaayeen Ceetaam,
iyo Cayn, iyo Rimmon, iyo Token, iyo Caashaan, oo waxay
ahaayeen shan magaalo, 33 iyo kulli tuulooyinkoodii ku
wareegsanaa isla magaalooyinkaas ilaa tan iyo Bacal.
Kuwaasu waxay ahaayeen rugahoodii ay degganaayeen,
oo iyagu abtirisna way leeyihiin. 34 Oo Meshoobaab, iyo
Yamleeg, iyo Yooshaah oo ahaa ina Amasyaah, 35 iyo
Yoo'eel, iyo Yeehuu oo ahaa ina Yooshibyaah ina Seraayaah,
ina Casii'eel, 36 iyo Eliyooceenay, iyo Yacaqobaah, iyo
Yeshooxaayaah, iyo Casaayaah, iyo Cadii'eel, iyo Yesiimi'eel,
iyo Benaayaah, 37 iyo Siisaa oo ahaa ina Shifcii ina Alloon
oo ahaa reer Yedacyaah oo ka ahaa reer Shimrii oo ka
sii ahaa reer Shemacyaah, 38 intaas magacyadooda la
sheegay waxay ahaayeen amiirradii qolooyinkooda, oo
reerahooduna aad bay si weyn ugu kordheen. 39 Oo
waxay tageen meesha Gedoor laga galo iyo xataa tan
iyo dooxadii dhankeeda bari si ay idahooda daaq ugu
doondoonaan. 40 Oo waxay halkaas ka heleen daaq cosob
ah oo wanaagsan, oo dhulkuna wuu ballaadhnaa, wuxuuna
ahaa dal xasilloon oo nabdoon, waayo, kuwii halkaas
waagii hore degganaan jiray waxay ahaayeen reer Xaam.
41 Oo kuwan magacyadooda la qoray waxay dalka soo
galeen waagii boqorkii reer Yahuudah, oo Xisqiyaah ahaa,
oo waxay dumiyeen teendhooyinkoodii oo laayeen reer
Mecuuniimkii halkaas laga helay, dhammaantoodna way
wada baabbi'iyeen, ilaa maantadan la joogo, oo meeshoodii
bay degeen, maxaa yeelay, meeshaasu waxay lahayd
daaq ay idahoodu daaqaan. 42 Oo iyaga qaarkood oo
ahaa reer Simecoon oo tiradoodu ahayd shan boqol oo
nin waxay tageen Buur Seciir, oo waxaa saraakiil u ahaa
Felatyaah, iyo Necaryaah, iyo Refaayaah, iyo Cusii'eel oo
wada ahaa wiilashii Yishcii. 43 Oo waxay soo laayeen
kuwii reer Camaaleq ka hadhay oo baxsaday, oo halkaasay
deggan yihiin ilaa maantadan la joogo.

**5** Oo kuwanuna waa wiilashii Ruubeen kaasoo ahaa
curadkii Israa'iil, (laakiinse isagu wuxuu nijaaseeyey
gogoshii aabbihiis oo sidaas daraaddeed curadnimadiisii
waxaa la siiyey wiilashii Yuusuf ina Israa'iil, oo abtiriskiisiina
laguma tirin xagga curadnimadiisii. 2 Yahuudah walaalihiis

wuu ka xoog badnaa, oo isaga xaggiisuu amiirku ka yimid,
laakiinse curadnimada waxaa iska lahaa Yuusuf: ) 3 oo
wiilashii Ruubeen oo ahaa curadkii Israa'iil waxay ahaayeen
Xanoog, iyo Falluu, iyo Xesroon, iyo Karmii. 4 Farcankii
Yoo'eelna wuxuu ahaa Shemacyaah oo dhalay Juuj, oo
isna dhalay Shimcii, oo isna dhalay Miikaah, 5 oo isna
dhalay Re'aayaah, oo isna dhalay Bacal, 6 oo isna dhalay
Be'eeraah, oo ahaa kii boqorkii Ashuur oo Tilgad Filneser la
odhan jiray uu maxaabiis ahaanta u kaxaystay, oo isna wuxuu
ahaa amiirkii reer Ruubeen. 7 Oo qolooyiinkii walaalihiis ahaa
markii abtiriskii dhalashadooda la tiriyey waxay ahaayeen
duqii Yecii'eel iyo Sekaryaah, 8 iyo Belac oo ahaa ina
Caasaas ina Shemac oo ahaa ina Yoo'eel oo degganaan
jiray Carooceer, iyo xataa tan iyo Nebo iyo Bacal Mecoon,
9 oo xagga barina wuxuu degganaan jiray tan iyo xataa
meesha laga galo cidlada markii laga soo bilaabo Webi
Yufraad, maxaa yeelay, xoolahoodii ayaa ku tarmay dalkii
Gilecaad. 10 Oo wakhtigii Saa'uul ayay la dagaallameen
reer Hagrii'iim, oo iyaga gacantooda ku baabba'ay, oo iyana
waxay degeen teendhooyinkoodii ku dhex yiil dalkii Gilecaad
bari ka xigay oo dhan. 11 Oo waxaa meel iyaga ka soo hor
jeedda, oo ah dalka Baashaan iyo tan iyo Salkaah degganaa
wiilashii Gaad 12 kuwaasoo ahaa Yoo'eel oo madax ahaa,
iyo Shaafaam oo ahaa kii labaad, iyo Yacnay, iyo Shaafaad,
waxay wada joogeen Baashaan, 13 oo walaalahood oo
ay isku reer ahaayeen waxay ahaayeen Miikaa'eel, iyo
Meshullaam, iyo Shebac, iyo Yooray, iyo Yackaam, iyo Siica,
iyo Ceeber, oo waxay ahaayeen toddoba. 14 Oo kuwanuna
waxay ahaayeen wiilashii Abiixayil ina Xuurii, oo ahaa ina
Yaaroo'ax, oo ahaa ina Gilecaad, oo ahaa ina Miikaa'eel,
oo ahaa ina Yeshiishay, oo ahaa ina Yaxdoo, oo ahaa ina
Buus; 15 Axii ina Cabdii'eel oo ahaa ina Guunii madax buu u
ahaa reerahoodii. 16 Oo waxay degganaayeen Gilecaad
oo Baashaan ku tiil iyo magaalooyinkeedii, iyo Shaaroon
agagaarkeedii oo dhan, iyo tan iyo soohdintooda meesha
ugu fog. 17 Oo kuwan oo dhan abtiriskooda waxaa la tiriyey
wakhtigii Yootam oo boqorkii dalka Yahuudah ahaa iyo
wakhtigii Yaaraabcaam oo boqorkii dalka Israa'iil ahaa. 18
Oo reer Ruubeen, iyo reer Gaad, iyo qabiilkii reer Manaseh
badhkiis raggoodii xoogga lahaa oo awoodda u lahaa inay
gaashaan iyo seef qaadaan, iyo inay qaansooyin ganaan,
oo dagaalyahannada ahaa waxay ahaayeen afar iyo afartan
kun iyo toddoba boqol iyo lixdan nin oo wada awooda inay
dagaal u baxaan. 19 Oo iyagu waxay la dagaallameen reer
Hagrii'iim iyo reer Yetuur, iyo reer Naafiish, iyo reer Naadaab.
20 Oo iyagiina waa looga hiiliyey, markaasaa reer Hagrii'iim
waxaa la soo geliyey gacantoodii, iyagii iyo kuwii kale oo
la jiray oo dhanba, waayo, intay dagaalka ku jireen ayay
Ilaah u qayshadeen, wuuna aqbalay, maxaa yeelay, isagay
isku halleeyeen. 21 Oo waxay iyagii ka dhaceen xoolahoodii
kuwaasoo ahaa geel ah konton kun, iyo ido ah laba boqol iyo
konton kun, iyo dameerro ah laba kun, iyo dad tiradiisu tahay
boqol qof. 22 Oo qaar badan baa laga laayay, maxaa yeelay,
dagaalku wuxuu ka yimid xag Ilaah. Oo meeshoodii bayna
degeen tan iyo waagii maxaabiisnimada. 23 Oo qabiilkii
reer Manaseh badhkoodna dalkay degeen, oo waxay ku
kordheen tan iyo Baashaan, iyo ilaa Bacal Xermoon, iyo tan
iyo Seniir, iyo ilaa Buur Xermoon. 24 Oo kuwii reerahooda
madaxda u ahaana waxay ahaayeen Ceefer, iyo Yishcii,
iyo Elii'eel, iyo Casrii'eel, iyo Yeremyaah, iyo Hoodawyaah,
iyo Yaxdii'eel, oo intaasu waxay wada ahaayeen rag xoog
badan oo magac leh oo reerahooda madax u ah. 25 Oo
iyagu waxay ku xadgudbeen Ilaahii awowayaashood, oo
sidii naag ninkeedii ka dhillowday ayay raaceen ilaahyadii
dadkii dalka degganaa, oo Ilaah hortooda ku baabbi'iyey. 26
Oo markaasaa Ilaah wuxuu kiciyey boqorkii Ashuur ee Fuul
ahaa, kaasoo ahaa boqorkii Ashuur oo Tilgad Filneser ahaa,
oo isna iyagii buu kaxaystay xataa reer Ruubeen, iyo reer
Gaad, iyo qabiilkii reer Manaseh badhkiis, oo wuxuu iyagii
geeyey Xalax, iyo Xaaboor, iyo Haaraa, iyo tan iyo webiga
Goosaan, oo halkaasay joogaan ilaa maantadan.

6 Wiilashii Laawina waxay ahaayeen Gershoon, iyo
Qohaad, iyo Meraarii. 2 Wiilashii Qohaadna waxay
ahaayeen Camraam, iyo Isehaar, iyo Xebroon, iyo Cusii'eel.
3 Ilmaha Camraamna waxay ahaayeen Haaruun, iyo
Muuse, iyo Maryan. Wiilashii Haaruunna waxay ahaayeen
Naadaab, iyo Abiihuu, iyo Elecaasaar, iyo Iitaamaar. 4
Elecaasaar wuxuu dhalay Fiinexaas, Fiinexaasna wuxuu
dhalay Abiishuuca, 5 Abiishuucana wuxuu dhalay Buqii,
Buqiina wuxuu dhalay Cusii, 6 Cusiina wuxuu dhalay
Seraxyaah, Seraxyaahna wuxuu dhalay Meraayood, 7
Meraayoodna wuxuu dhalay Amaryaah, Amaryaahna wuxuu
dhalay Axiituub, 8 Axiituubna wuxuu dhalay Saadooq,
Saadooqna wuxuu dhalay Axiimacas, 9 Axiimacasna wuxuu
dhalay Casaryaah, Casaryaahna wuxuu dhalay Yooxaanaan,
10 Yooxaanaanna wuxuu dhalay Casaryaah, (isagu wuxuu
ahaa kii hawsha wadaadnimada ka qaban jiray gurigii
Sulaymaan Yeruusaalem ka dhisay, ) 11 Casaryaahna wuxuu
dhalay Amaryaah, Amaryaahna wuxuu dhalay Axiituub,
12 Axiituubna wuxuu dhalay Saadooq, Saadooqna wuxuu
dhalay Shalluum, 13 Shalluumna wuxuu dhalay Xilqiyaah,
Xilqiyaahna wuxuu dhalay Casaryaah, 14 Casaryaahna
wuxuu dhalay Seraayaah, Seraayaahna wuxuu dhalay

Yehoosaadaaq, 15 Yehoosaadaaqna maxaabiis ahaan buu
tegey waagii Rabbigu dadkii Yahuudah iyo Yeruusaalem uu
gacantii Nebukadnesar ku kaxeeyey. 16 Wiilashii Laawina
waxay ahaayeen Gershoom, iyo Qohaad, iyo Meraarii. 17
Kuwanuna waa magacyadii wiilashii Gershoom, Libnii iyo
Shimcii. 18 Wiilashii Qohaadna waxay ahaayeen Camraam,
iyo Isehaar, iyo Xebroon, iyo Cusii'eel. 19 Wiilashii Meraariina
waxay ahaayeen Maxlii iyo Mushii. Oo intaasu waa qolooyinkii
reer Laawi iyo sidii ay reerahoodu ahaayeen. 20 Gershoom
waxaa ka soo farcamay wiilkiisii Libnii oo dhalay Yaaxad,
oo isna dhalay Simmaah, 21 oo isna dhalay Yoo'aax, oo
isna dhalay Iddo, oo isna dhalay Serax, oo isna dhalay
Ye'ateray. 22 Qohaadna waxaa ka soo farcamay wiilkiisii
Cammiinaadaab, oo dhalay Qorax, oo isna dhalay Asiir, 23
oo isna dhalay Elqaanaah, oo isna dhalay Ebiyaasaaf, oo
isna dhalay Asiir, 24 oo isna dhalay Taxad, oo isna dhalay
Uurii'eel, oo isna dhalay Cusiyaah, oo isna dhalay Shaa'uul.
25 Wiilashii Elqaanaahna waxay ahaayeen Camaasay iyo
Axiimood. 26 Oo xagga Elqaanaahna waxaa ka soo farcamay
Soofay, oo dhalay Nahad, 27 oo isna dhalay Elii'aab, oo isna
dhalay Yeroxaam, oo isna dhalay Elqaanaah. 28 Wiilashii
Samuu'eelna waxay ahaayeen curadkiisii oo ahaa Yoo'eel,
iyo kii labaad oo ahaa Abiiyaah. 29 Farcankii Meraariina
wuxuu ahaa Maxlii, oo dhalay Libnii, oo isna dhalay Shimcii,
oo isna dhalay Cuusaah, 30 oo isna dhalay Shimcaa, oo isna
dhalay Xaggiyaah, oo isna dhalay Casaayaah. 31 Kuwanuna
waa kuwii Daa'uud u sarraysiiyey hawshii gabayga oo
gurigii Rabbiga ku dhex jirtay markii sanduuqii axdiga
meeshaas la dhigay dabadeed. 32 Oo iyagu taambuugga
teendhadii shirka horteeda ayay gabay kaga adeegi jireen,
ilaa Sulaymaan uu Yeruusaalem ka dhex dhisay gurigii
Rabbiga, oo iyana hawshooda waxay u qaban jireen siday u
kala horhorreeyeen. 33 Oo intanu waa kuwii adeegi jiray
iyo wiilashoodii. Kuwii ka mid ahaa reer Qohaad waxay
ahaayeen Heemaan oo gabayaa ahaa, ina Yoo'eel, ina
Samuu'eel, 34 ina Elqaanaah, ina Yeroxaam, ina Elii'eel,
ina Too'ax, 35 ina Suuf, ina Elqaanaah, ina Maxad, ina
Camaasay, 36 ina Elqaanaah, ina Yoo'eel, ina Casaryaah,
ina Sefanyaah, 37 ina Taxad, ina Asiir, ina Ebiyaasaaf, ina
Qorax, 38 ina Isehaar, ina Qohaad, ina Laawi, ina Israa'iil.
39 Walaalkiis Aasaaf oo gacantiisii midig istaagi jiray wuxuu
ahaa Aasaaf ina Berekyaah, ina Shimcaa, 40 ina Miikaa'eel,
ina Bacaseeyaah, ina Malkiiyaah, 41 ina Etnii, ina Serax, ina
Cadaayaah, 42 ina Eetaan, ina Simmaah, ina Shimcii, 43 ina
Yaxad, ina Gershoom, ina Laawi. 44 Oo iyaga gacantooda
midigtana waxaa istaagi jiray walaalahood oo ahaa reer
Meraarii, Eetaan oo ahaa ina Qiishii, ina Cabdii, ina Malluug,
45 ina Xashabyaah, ina Amasyaah, ina Xilqiyaah, 46 ina
Amsii, ina Baanii, ina Shemer, 47 ina Maxlii, ina Mushii,
ina Meraarii, ina Laawi. 48 Oo walaalahood oo ahaa reer
Laawina waxaa loo doortay inay ka adeegaan taambuuggii
guriga Ilaah oo dhan. 49 Laakiinse Haaruun iyo wiilashiisu
waxay meesha allabariga la gubo iyo girgiraha fooxa wax
ugu bixin jireen shuqulkii meesha ugu quduuska ah oo dhan
iyo inay reer binu Israa'iil kafaaraggud ugu sameeyaan,
sidii dhammaan addoonkii Ilaah ee Muuse ahaa amray. 50
Oo kuwanuna waa farcankii Haaruun, wiilkiisii Elecaasaar,
oo dhalay Fiinexaas, oo isna dhalay Abiishuuca, 51 oo
isna dhalay Buqii, oo isna dhalay Cusii, oo isna dhalay
Seraxyaah, 52 oo isna dhalay Meraayood, oo isna dhalay
Amaryaah, oo isna dhalay Axiituub, 53 oo isna dhalay
Saadooq, oo isna dhalay Axiimacas. 54 Haddaba kuwanu
waa meelahoodii ay degi jireen iyo sidii degmooyinkoodu
ahaayeen kuwaasoo ku dhex yiil soohdimahooda. Reer
Haaruun oo ah qolooyinka reer Qohaad, oo saamiga kowaad
lahaa, 55 waxaa la siiyey Xebroon oo ku dhex tiil dalka reer
Yahuudah, iyo agagaarkeedii ku wareegsanaa oo dhanba.
56 Laakiinse magaalada beeraheedii iyo tuulooyinkeediiba
waxaa la siiyey Kaaleeb oo ahaa ina Yefunneh. 57 Reer
Haaruunna waxaa la siiyey magaalooyinkii magangalka
oo ah Xebroon, iyo Libnaah iyo weliba agagaarkeed, iyo
Yatiir, iyo Eshtemooca iyo agagaarkeedii, 58 iyo Xiileen iyo
agagaarkeedii, iyo Debiir iyo agagaarkeedii, 59 iyo Caashaan
iyo agagaarkeedii, iyo Beytshemesh iyo agagaarkeedii. 60
Oo dalkii qabiilka reer Benyaamiinna waxaa laga siiyey
Gebac iyo agagaarkeedii, iyo Calemed iyo agagaarkeedii, iyo
Canaatood iyo agagaarkeedii. Oo kulli magaalooyinkoodii oo
qolooyinkooda oo dhan ku dhex yiil waxay ahaayeen saddex
iyo toban magaalo. 61 Oo reer Qohaad intiisii hadhayna
waxaa saami loo siiyey toban magaalo oo ay ka dhex heleen
reerka qabiilka iyo qabiilka badhkiisii, kaasoo ah qabiilkii
reer Manaseh badhkiis. 62 Oo reer Gershoomna sidii ay
reerahoodu ahaayeen ayay saddex iyo toban magaalo uga
heleen qabiilka reer Isaakaar, iyo qabiilka reer Aasheer, iyo
qabiilka reer Naftaali, iyo qabiilka reer Manaseh oo Baashaan
dhex deggan. 63 Oo reer Meraarii waxaa saami loogu siiyey
siday reerahoodu ahaayeen laba iyo toban magaalo oo ay
ka dhex heleen qabiilka reer Ruubeen, iyo qabiilka reer
Gaad, iyo qabiilka reer Sebulun. 64 Oo reer binu Israa'iilna
waxay reer Laawi siiyeen magaalooyinkii iyo agagaarkoodii
oo dhan. 65 Oo saami ahaan ayay magaalooyinkan la
magacaabay uga siiyeen qabiilka reer Yahuudah, iyo qabiilka
reer Simecoon, iyo qabiilka reer Benyaamiin. 66 Reerihii
Qohaad qaarkoodna waxay magaalooyin ku lahaayeen

meelo soohdintooda ah oo ay ka heleen qabiilka reer
Efrayim. 67 Oo iyaga waxaa la siiyey magaalooyinkii
magangalka, oo waxayna ahaayeen Shekem oo ku dhex
tiil dalka buuraha leh oo reer Efrayim iyo agagaarkeedii,
iyo weliba Geser iyo agagaarkeedii, 68 iyo Yoqmecaam
iyo agagaarkeedii, iyo Beytxooroon iyo agagaarkeedii, 69
iyo Ayaaloon iyo agagaarkeedii, iyo Gad Rimmoon iyo
agagaarkeedii. 70 Oo qabiilkii reer Manaseh badhkiisna
waxaa laga dhex siiyey Caaneer iyo agagaarkeedii, iyo
Bilcaam iyo agagaarkeedii, reer Qohaad intooda hadhay
aawadood. 71 Oo reer Gershoomna waxaa qabiilka reer
Manaseh badhkiisii laga siiyey Goolaan oo Baashaan ku
taal iyo agagaarkeedii, iyo Cashtarod iyo agagaarkeedii.
72 Oo qabiilka reer Isaakaarna waxaa laga siiyey Qedesh
iyo agagaarkeedii, iyo Daaberad iyo agagaarkeedii, 73 iyo
Raamod iyo agagaarkeedii, iyo Caaneem iyo agagaarkeedii.
74 Oo qabiilkii reer Aasheerna waxaa laga siiyey Maashaal
iyo agagaarkeedii, iyo Cabdoon iyo agagaarkeedii, 75 iyo
Xuuqoq iyo agagaarkeedii, iyo Rexob iyo agagaarkeedii.
76 Oo qabiilkii reer Naftaalina waxaa laga siiyey Qedesh
oo Galili ku taal iyo agagaarkeedii, iyo Xammoon iyo
agagaarkeedii, iyo Qiryaatayim iyo agagaarkeedii. 77 Oo reer
Laawi intoodii hadhay oo ahayd reer Meraarii waxaa qabiilka
reer Sebulun laga siiyey Rimmoonoo iyo agagaarkeedii, iyo
Taaboor iyo agagaarkeedii. 78 Oo Webi Urdun shishadiisa oo
ah Yerixoo agteeda oo ah Webi Urdun xaggiisa bari waxaa
qabiilka reer Ruubeenna laga siiyey Beser oo cidlada ku taal
iyo agagaarkeedii, iyo Yahsaah iyo agagaarkeedii, 79 iyo
Qedemood iyo agagaarkeedii, iyo Mefacad iyo agagaarkeedii.
80 Oo qabiilka reer Gaadna waxaa laga siiyey Raamod
oo Gilecaad ku taal iyo agagaarkeedii, iyo Maxanayim iyo
agagaarkeedii, 81 iyo Xeshboon iyo agagaarkeedii, iyo
Yacser iyo agagaarkeedii.

7 Wiilashii Isaakaarna waxay ahaayeen Toolac, iyo Fuwaah,
iyo Yaashuub, iyo Shimroon, afar bay ahaayeen. 2
Wiilashii Toolacna waxay ahaayeen Cusii, iyo Refaayaah,
iyo Yerii'eel, iyo Yahmay, iyo Yibsaam, iyo Shemuu'eel, oo
waxay ahaayeen madaxdii reerahoodii oo ahaa reer Toolac,
oo qarnigoodiina rag xoog badan bay ku ahaayeen. Wakhtigii
Daa'uud joogayna tiradoodu waxay ahayd laba iyo labaatan
kun iyo lix boqol. 3 Farcankii Cusiina waxay ahaayeen
Yisraxyaah, iyo wiilashii Yisraxyaah oo ahaa Miikaa'eel,
iyo Cobadyaah, iyo Yoo'eel, iyo Yishiyaah, oo waxay isku
ahaayeen shan, dhammaantoodna waxay ahaayeen rag
madax ah. 4 Oo iyaga waxaa la jiray guutooyin ah ciidankii
dagaalka sidii ay u kala dhasheen iyo sidii reerahoodu
ahaayeen, waxayna ahaayeen lix iyo soddon kun oo nin,
waayo, waxay lahaayeen naago iyo wiilal badan. 5 Oo
walaalahoodii qolooyinka reer Isaakaar ku dhex jiray oo
dhammu waxay ahaayeen rag xoog badan, oo kulligoodna
abtiriskooda la tiriyey, oo waxayna ahaayeen toddoba iyo
siddeetan kun oo qof. 6 Wiilashii Benyaamiinna waxay
ahaayeen Belac, iyo Beker, iyo Yediica'eel, oo ahaa saddex.
7 Wiilashii Belacna waxay ahaayeen Esboon, iyo Cusii,
iyo Cusii'eel, iyo Yeriimood, iyo Ciirii, oo ahaa shan, oo
reerahoodana madax bay u ahaayeen, rag xoog badan
bayna ahaayeen, oo abtiriskoodana waa la tiriyey, oo
waxay ahaayeen laba iyo labaatan kun iyo afar iyo soddon
nin. 8 Wiilashii Bekerna waxay ahaayeen Semiiraah, iyo
Yoo'aash, iyo Eliiceser, iyo Eliyooceenay, iyo Comrii, iyo
Yereemood, iyo Abiiyaah, iyo Canaatood, iyo Calemed.
Oo intaas oo dhammu waxay wada ahaayeen wiilashii
Beker. 9 Oo iyaga sidii abtiriskoodii ahaa waa loo tiriyey
iyo sidii ay u kala dhasheen, oo waxay ahaayeen madaxdii
reerahooda oo ah rag xoog badan, tiradooduna waxay ahayd
labaatan kun iyo laba boqol. 10 Farcankii Yediica'eelna
waxay ahaayeen Bilhaan, iyo wiilashii Bilhaan oo ahaa
Yecuush iyo Benyaamiin, iyo Eehuud, iyo Kenacanaah,
iyo Seetaan, iyo Tarshiish, iyo Axiishaxar. 11 Oo intaas
oo dhammu waxay ahaayeen farcankii Yediica'eel sidii ay
ahaayeen madaxdii reerahoodu, rag xoog badan bayna
ahaayeen, oo intoodii dagaal aawadiis ciidanka u geli kartay
waxay ahaayeen toddoba iyo toban kun iyo laba boqol, 12 iyo
weliba Shufiim iyo Xufiim oo ahaa wiilashii Ciir, iyo Xushiim
oo ahaa ina Axeer. 13 Wiilashii Naftaalina waxay ahaayeen
Yaxsii'eel, iyo Guunii, iyo Yeser, iyo Shalluum, oo intaasu
waxay ahaayeen wiilashii Bilhah. 14 Wiilashii Manasehna
waxay ahaayeen Casrii'eel, oo ay naagtiisii dhashay: (oo
naagtiisii addoonta ahaydna waxay u dhashay Maakiir oo
ahaa Gilecaad aabbihiis, 15 Maakiirna wuxuu guursaday
walaashii Xufiim iyo Shufiim, oo magaceedana waxaa la
odhan jiray Macakaah, ) oo wiilkii labaad magiciisana waxaa
la odhan jiray Selaafexaad, oo Selaafexaadna wuxuu lahaa
gabdho. 16 Oo Macakaah oo ahayd Maakiir naagtiisiina
waxay dhashay wiil, oo magiciisiina waxay u bixisay Feresh,
oo walaalkiis magiciisana waxaa la odhan jiray Shereesh,
wiilashiisiina waxay ahaayeen Uulaam iyo Raaqem. 17 Ina
Uulaamna wuxuu ahaa Bedaan. Kuwaasu waxay ahaayeen
wiilashii Gilecaad oo ahaa ina Maakiir, oo ka sii ahaa
ina Manaseh. 18 Oo walaashiis Hammolekedna waxay
dhashay Iishood, iyo Abiiceser, iyo Maxlaah. 19 Wiilashii
Shemiidaacna waxay ahaayeen Axyaan, iyo Shekem, iyo
Liqxii, iyo Aniicaam. 20 Farcankii Efrayimna waxay ahaayeen

Shuutelax oo dhalay Bered, oo isna dhalay Taxad, oo isna dhalay Elcaadaah, oo isna dhalay Taxad, 21 oo isna dhalay Saabaad, oo isna dhalay Shuutelax, iyo weliba Ceser, iyo Elcaad oo ay dileen dadkii reer Gad oo dalka ku dhashay, maxaa yeelay, iyagu waxay u soo degeen inay xoolahooda dhacaan. 22 Oo aabbahood Efrayimna maalmo badan ayuu aawadood u barooranayay, laakiinse waxaa isaga u yimid walaalihiis inay tacsiyeeyaan. 23 Oo isna markaasuu naagtiisii u tegey, kolkaasay uuraysatay oo waxay dhashay wiil. Markaasuu magiciisii u bixiyey Beriicaah, maxaa yeelay, belaayaa reerkiisii ku dhacday. 24 Oo gabadhiisana waxaa la odhan jiray She'eraah, oo iyadu waxay dhistay Beytxooroon tan hoose iyo tan sareba, iyo weliba Useen She'eraah. 25 Oo wuxuu dhalay Refax, oo isna dhalay Reshef, iyo wiilkiisii Telax, oo isna dhalay Tahan, 26 oo isna dhalay Lacdaan, oo isna dhalay Cammiihuud, oo isna dhalay Eliishaamaa, 27 oo isna dhalay Nuun, oo isna dhalay Yashuuca. 28 Oo hantidoodii iyo hoygoodiiba waxay ahaayeen Beytel iyo magaalooyinkeeda, iyo xagga bari Nacaraan, iyo xagga galbeed Geser, iyo magaalooyinkeeda, iyo weliba Shekem iyo magaalooyinkeedii, iyo Casaah iyo magaalooyinkeedii, 29 iyo xagga reer Manasehna Beytshe'aan iyo magaalooyinkeedii, iyo Tacanaag iyo magaalooyinkeedii, iyo Megiddoo iyo magaalooyinkeedii, iyo Door iyo magaalooyinkeedii. Magaalooyinkaas waxaa degganaa reer Yuusuf ina Israa'iil. 30 Ilma Aasheerna waxay ahaayeen Yimnaah, iyo Yishwaah, iyo Yishwii, iyo Beriicaah, iyo Serax oo ahayd walaashood. 31 Wiilashii Beriicaahna waxay ahaayeen Xeber, iyo Malkii'eel oo ahaa Birsaawid aabbihiis. 32 Oo Xeber wuxuu dhalay Yafleed, iyo Shomeer, iyo Xootaam, iyo walaashood Shuucaa. 33 Wiilashii Yafleedna waxay ahaayeen Faasag, iyo Bimhaal, iyo Cashwaad. Intaasu waa ilma Yafleed. 34 Wiilashii Shemerna waxay ahaayeen Axii, iyo Raahgaah, iyo Yehubbaah, iyo Araam. 35 Oo walaalkiisii Xeelem wiilashiisiina waxay ahaayeen Soofax, iyo Yimnaac, iyo Sheelesh iyo Caamaal. 36 Wiilashii Soofaxna waxay ahaayeen Suu'ax, iyo Xarnefer, iyo Shuucaal, iyo Beerii, iyo Yimraah, 37 iyo Beser, iyo Xood, iyo Shammaa, iyo Shilshaah, iyo Yitraan, iyo Be'eeraa. 38 Wiilashii Yeterna waxay ahaayeen Yefunneh, iyo Fisfaah, iyo Araa. 39 Wiilashii Cullaana waxay ahaayeen Aarax, iyo Xannii'eel, iyo Risyaa. 40 Oo kulli intaas oo dhammuna waxay wada ahaayeen ilma Aasheer oo ah madaxdii reerahooda, oo waxay ahaayeen rag xoog badan oo la doortay, oo weliba waxay ahaayeen madaxdii amiirrada. Oo tiradoodii abtiriska loogu tiriyey hawsha dagaalka waxay ahayd lix iyo labaatan kun oo nin.

**8** Oo Benyaamiinna wuxuu dhalay Belac oo ahaa curadkiisii, iyo Ashbeel oo ahaa kii labaad, iyo Axrax oo ahaa kii saddexaad, 2 iyo Nooxaah oo ahaa kii afraad, iyo Rafaa oo ahaa kii shanaad. 3 Oo Belacna wiilal buu lahaa, oo waxay ahaayeen Addaar, iyo Geeraa, iyo Abiihuud, 4 iyo Abiishuuca, iyo Nacaman, iyo Axoo'ax, 5 iyo Geeraa, iyo Shefuufaan, iyo Xuuraam. 6 Kuwanuna waa wiilashii Eehuud, oo waxay ahaayeen madaxdii reerahooda oo ahaa dadkii Gebac degganaa, oo iyaga maxaabiis ahaan waa loogu kaxaystay Maanahad. 7 Oo weliba wuxuu maxaabiis ahaan u kaxaystay Nacaman, iyo Axiiyaah, iyo Geeraa, oo wuxuu dhalay Cuusaah iyo Axiixud. 8 Oo Shaxarayimna wuxuu carruur ku dhalay dalkii Moo'aab markuu iska diray naagihiisii ahaa Xushiim iyo Bacaraa dabadeed. 9 Oo naagtiisii Xodeshna wuxuu ka dhalay Yoobaab, iyo Sibyaa, iyo Meeshaa, iyo Malkaam, 10 iyo Yecuus, iyo Shaakyaah, iyo Mirmaah. Intaasu waa wiilashiisii oo waxay ahaayeen madaxdii reerahooda. 11 Oo Xushiimna wuxuu ka dhalay Abiituub iyo Elfacal. 12 Wiilashii Elfacalna waxay ahaayeen Ceeber iyo Mishcaam iyo Shemed oo ahaa kii dhisay Oonoo iyo Lod iyo magaalooyinkooda oo dhan, 13 iyo Beriicaah, iyo Shemac, oo ahaa madaxdii reeraha dadkii Ayaaloon degganaa oo ahaa kuwii eryay dadkii Gad degganaa, 14 iyo Axiyoo, iyo Shaashaq, iyo Yereemood, 15 iyo Sebadyaah, iyo Caraad, iyo Ceeder, 16 iyo Miikaa'eel, iyo Yishfaah, iyo Yooxaa, oo ahaa wiilashii Beriicaah, 17 iyo Sebadyaah, iyo Meshullaam, iyo Xisqii, iyo Xeber, 18 iyo Yishmeray, iyo Isliyaah, iyo Yoobaab, oo ahaa wiilashii Elfacal, 19 iyo Yaaqiim, iyo Sikrii, iyo Sabdii, 20 iyo Eliiceenay, iyo Silletay, iyo Elii'eel, 21 iyo Cadaayaah, iyo Beraayaah, iyo Shimraad, oo wada ahaa wiilashii Shimcii, 22 iyo Yishfaan, iyo Ceeber, iyo Elii'eel, 23 iyo Cabdoon, iyo Sikrii iyo Xaanaan, 24 iyo Xananyaah, iyo Ceelaam, iyo Cantotiyaah, 25 iyo Yifdeyaah, iyo Fenuu'eel, oo wada ahaa wiilashii Shaashaq, 26 iyo Shamsheray, iyo Shexaryaah, iyo Catalyaah, 27 iyo Yacareshyaah, iyo Eliiyaah, iyo Sikrii, oo wada ahaa wiilashii Yeroxaam. 28 Oo kuwaasu qarniyadoodii oo dhan waxay ahaayeen madaxdii reerahooda, oo waxay degganaayeen Yeruusaalem. 29 Oo Gibecoonna waxaa degganaa Gibecoon aabbihiis Yecii'eel, oo naagtiisa magaceedana waxaa la odhan jiray Macakaah, 30 iyo curadkiisii Cabdoon ahaa, iyo Suur, iyo Qiish, iyo Bacal, 31 iyo Naadaab, iyo Gedoor, iyo Axiyoo, iyo Seker. 32 Miqloodna wuxuu dhalay Shime'aah. Iyana walaalahood ayay la degganaayeen Yeruusaalem meel walaalahood ka soo hor jeedda. 33 Neerna wuxuu dhalay Qiish, Qiishna wuxuu dhalay Saa'uul, Saa'uulna wuxuu dhalay Yoonaataan, iyo Melkiishuuca, iyo Abiinaadaab, iyo

Eshbacal. **34** Wiilkii Yoonaataanna wuxuu ahaa Meriibacal,
Meriibacalna wuxuu dhalay Miikaah. **35** Wiilashii Miikaahna
waxay ahaayeen Fiitoon, iyo Meleg, iyo Tareeca, iyo Aaxaas.
**36** Aaxaasna wuxuu dhalay Yehoocaddaah, Yehoocaddaahna
wuxuu dhalay Calemed, iyo Casmaawed, iyo Simrii, Simriina
wuxuu dhalay Moosaa. **37** Moosaana wuxuu dhalay Bincaa,
oo wiilkiisiina wuxuu ahaa Rafaah, oo dhalay Elecaasaah,
oo isna dhalay Aaseel. **38** Aaseelna wuxuu lahaa lix wiil, oo
magacyadoodiina waa kuwan: Casriiqaam, iyo Bokeruu, iyo
Ismaaciil, iyo Shecaryaah, iyo Cobadyaah, iyo Xaanaan. Oo
kulli intaas oo dhammu waxay ahaayeen wiilashii Aaseel.
**39** Ceesheq oo ahaa walaalkiis wiilashiisiina waa kuwan,
Uulaam oo curadkiisii ahaa, iyo Yecuush oo ahaa kii labaad,
iyo Eliifeled oo ahaa kii saddexaad. **40** Wiilashii Uulaamna
waxay ahaayeen rag xoog badan, iyo qaansoley, oo waxay
lahaayeen wiilal badan iyo wiilal ay wiilashoodu sii dhaleen,
oo isku ah boqol iyo konton nin. Oo intaas oo dhammuna
waxay ka yimaadeen wiilashii Benyaamiin.

**9** Sidaasaa reer binu Israa'iil oo dhan loogu abtiriyey, oo
bal eeg, iyagu waxay ku qoran yihiin kitaabkii boqorrada
reer binu Israa'iil. Oo dadkii Yahuudahna xadgudubkoodii
aawadiis ayaa maxaabiis ahaan loogu kaxaystay Baabuloon.
**2** Haddaba kuwii ugu horreeyey oo degay dalkii ay hantiyeen
iyo magaalooyinkoodii waxay ahaayeen reer binu Israa'iil,
wadaaddadii, iyo kuwii reer Laawi, iyo reer Netiiniim. **3**
Oo Yeruusaalem waxaa ka degganaa reer Yahuudah, iyo
reer Benyaamiin, iyo reer Efrayim, iyo reer Manaseh: **4**
Cuutay oo ahaa ina Cammiihuud, ina Coomrii, ina Imrii, ina
Baanii oo ahaa reer Feres oo ahaa wiilkii Yahuudah. **5** Oo
reer Shiilohna waxaa ka degganaa Casaayaah oo ahaa
curadkii iyo wiilashiisii. **6** Reer Seraxna waxaa ka joogay
Yecuu'eel iyo walaalahood, oo waxay ahaayeen lix boqol iyo
sagaashan. **7** Oo reer Benyaamiinna waxaa ka joogay Sallu
oo ahaa ina Meshullaam, ina Hoodawyaah, ina Hasenu'aah,
**8** iyo Yibneyaah oo ahaa ina Yeroxaam, iyo Eelaah oo ahaa
ina Cusii, ina Mikrii, iyo Meshullaam oo ahaa ina Shefatyaah,
ina Recuu'eel, ina Yibniyaah, **9** iyo walaalahood oo ahaa
sidii dhalashadoodu ahayd, oo waxayna ahaayeen sagaal
boqol iyo lix iyo konton. Oo nimankaas oo dhammu waxay
ahaayeen madaxdii reerahooda siday kala reer u ahaayeen.
**10** Oo wadaaddadiina waxaa ka joogay Yedacyaah, iyo
Yehooyaariib, iyo Yaakiin, **11** iyo Casaryaah oo ahaa ina
Xilqiyaah, ina Meshullaam, ina Saadooq, ina Meraayood, ina
Axiituub oo ahaa taliyihii guriga Ilaah, **12** iyo Cadaayaah oo
ahaa ina Yeroxaam, ina Fashxuur, ina Malkiiyaah, iyo Macsay
oo ahaa ina Cadii'eel, ina Yaxseraah, ina Meshullaam, ina
Meshilleemiid, ina Immeer, **13** iyo walaalahood oo ahaa
madaxdii reerahooda, oo tiradooduna ahayd kun iyo toddoba
boqol iyo lixdan, oo waxayna ahaayeen rag aad karti ugu
leh shuqulka adeegidda guriga Ilaah. **14** Oo reer Laawina
waxaa ka joogay Shemacyaah oo ahaa ina Xashuub, ina
Casriiqaam, ina Xashabyaah oo ahaa reer Meraarii, **15** iyo
Baqbaqar, iyo Xeresh, iyo Gaalaal, iyo Matanyaah oo ahaa
ina Miikaa, ina Sikrii, ina Aasaaf, **16** iyo Cobadyaah oo ahaa
ina Shemacyaah, ina Gaalaal, ina Yeduutuun, iyo Berekyaah
oo ahaa ina Aasaa, ina Elqaanaah, kaasoo degganaan jiray
tuulooyinkii reer Netofaah. **17** Oo iridjoogayaashiina waxaa
ka joogay Shalluum, iyo Caquub, iyo Talmon, iyo Axiiman,
iyo walaalahood, oo waxaa iyaga madax u ahaa Shalluum,
**18** oo ilaa maantadan la joogo boqorka iriddiisa xaggeeda
bari joogi jiray, oo iyagu waxay iridjoogayaal u ahaayeen
xeradii reer Laawi. **19** Oo Shalluum ina Qore oo ahaa ina
Ebiyaasaaf, ina Qorax, iyo walaalihiis oo ahaa reer Qorax,
waxay u talin jireen shuqulkii adeegidda, oo waxay ahaayeen
waardiyayaashii irdaha taambuugga, oo awowayaashoodna
waxay u talin jireen xeradii Rabbiga, oo waxay ahaayeen
waardiyayaashii iridda. **20** Oo waagii hore waxaa iyaga
madax u ahaan jiray Fiinexaas oo ahaa ina Elecaasaar,
oo Rabbiguna isaga wuu la jiri jiray. **21** Oo Sekaryaah
ina Meshelemyaahna wuxuu ahaan jiray iridjoogihii iridda
teendhadii shirka. **22** Oo kulligood intaas loo doortay inay
iridjoogayaal ahaadaan waxay dhammaantood ahaayeen
laba boqol iyo laba iyo toban. Oo kuwaas abtiriskooda
waxaa lagu tiriyey tuulooyinkoodii, kuwaasoo Daa'uud iyo
Samuu'eel oo ahaa waxarkihii ay u doorteen shuqulkoodii
lagu aaminay. **23** Haddaba iyaga iyo carruurtooduba waxay
u sarrayn jireen irdaha guriga Rabbiga, kaasoo ahaa
gurigii taambuugga iyagoo waardiyayaal ah. **24** Oo afarta
dhinacba waxaa joogay iridjoogayaashii xagga bari, iyo
xagga galbeed, iyo xagga woqooyi, iyo xagga koonfureedba.
**25** Oo walaalahoodii tuulooyinkooda joogayna had iyo goor
toddobadii maalmoodba way u iman jireen inay iyaga la
joogaan, **26** waayo, afarta iridjooge oo sare oo ahaa reer
Laawi waxay ku jireen jagooyin joogto ah, oo waxay u talin
jireen qolalka, iyo khasnadihii guriga Ilaah. **27** Oo iyagu
waxay u hoyan jireen guriga Ilaah hareerihiisa, maxaa yeelay,
ilaalinta gurigu iyagay saarnayd, oo waxaa iyaga joogto u
ahaa inay subax kasta furaan. **28** Oo iyaga qaarkoodna
waxay u talin jireen weelasha lagu adeego, waayo, weelasha
tiraa lagu soo gelin jiray, oo tiraa lagu bixin jiray. **29** Oo
iyaga qaarkood kalena waxaa loo doortay inay u taliyaan
alaabta guriga iyo weelasha meesha quduuska ah oo
dhan, iyo burka, iyo khamriga, iyo saliidda, iyo fooxa, iyo

uunsiga. 30 Oo wiilashii wadaaddada qaarkoodna waxay
hagaajin jireen cadarkii uunsiga lahaa. 31 Oo Matityaah
oo ka mid ahaa reer Laawi, oo ahaa curadkii Shalluum oo
ahaa reer Qorax shuqulkiisii joogtada ahaa wuxuu ahaa inuu
ilaaliyo waxyaalaha digsiyada lagu dubo. 32 Oo walaalahood
qaarkood oo reer Qohaad ahaana waxay u talin jireen kibistii
tusniinta, si ay sabti kasta u diyaariyaan. 33 Oo kuwanuna
waa nimankii gabayaaga ahaa oo ahaa madaxdii qolooyinka
reer Laawi, oo waxay joogi jireen qolalka oo hawl kalena
ma ay hayn, waayo, iyagu habeen iyo maalinba waxay
qabanayeen shuqulkoodii. 34 Kuwaasu waxay ahaayeen
madaxdii qolooyinka reer Laawi, oo qarniyadoodii oo dhan
waxay ahaayeen rag madax ah, oo waxay degganaan
jireen Yeruusaalem. 35 Oo Gibecoonna waxaa degganaa
Gibecoon aabbihiis oo la odhan jiray Yecii'eel, oo naagtiisa
magaceedana waxaa la odhan jiray Macakaah, 36 iyo
curadkiisii Cabdoon ahaa, iyo Suur, iyo Qiish, iyo Bacal, iyo
Neer, iyo Naadaab, 37 iyo Gedoor, iyo Axiyoo, iyo Sekaryaah,
iyo Miqlood. 38 Miqloodna wuxuu dhalay Shime'aam. Iyana
walaalahood ayay la degganaayeen Yeruusaalem meel
walaalahood ka soo hor jeedda. 39 Neerna wuxuu dhalay
Qiish, Qiishna wuxuu dhalay Saa'uul, Saa'uulna wuxuu
dhalay Yoonaataan, iyo Malkiishuuca, iyo Abiinaadaab, iyo
Eshbacal. 40 Wiilkii Yoonaataanna wuxuu ahaa Meriibacal,
Meriibacalna wuxuu dhalay Miikaah. 41 Wiilashii Miikaahna
waxay ahaayeen Fiitoon, iyo Meleg, iyo Taxreeca iyo Aaxaas.
42 Aaxaasna wuxuu dhalay Yacraah, Yacraahna wuxuu
dhalay Calemed, iyo Casmaawed, iyo Simrii, Simriina wuxuu
dhalay Moosaa. 43 Moosaana wuxuu dhalay Bincaa, oo
wiilkiisiina wuxuu ahaa Refaayaah, oo dhalay Elecaasaah,
oo isna dhalay Aaseel, 44 Aaseelna wuxuu lahaa lix wiil, oo
magacyadoodiina waa kuwan: Casriiqaam, iyo Bokeruu, iyo
Ismaaciil, iyo Shecaryaah, iyo Cobadyaah, iyo Xaanaan.
Intaasu waxay ahaayeen wiilashii Aaseel.

**10** Haddaba reer Falastiin waxay la dirireen reer binu
Israa'iil, oo raggii reer binu Israa'iilna way ka carareen
reer Falastiin, oo Buur Gilboca ayay ku daateen iyagoo la
laayay. 2 Oo reer Falastiin aad bay u eryadeen Saa'uul
iyo wiilashiisii, markaasaa reer Falastiin waxay dileen
Yoonaataan, iyo Abiinaadaab, iyo Malkiishuuca oo ahaa
Saa'uul wiilashiisii. 3 Oo dagaalkiina aad buu ugu sii
kululaaday Saa'uul, oo waxaa isagii gaadhay qaansoleydii,
oo isna qaansoleydii aawadeed ayuu dhib badan ula kulmay.
4 Markaasaa Saa'uul wuxuu kii hubka u siday ku yidhi, War
seeftaada la soo bax oo iga mudhbixi, waaba intaasoo
buuryoqabyadanu yimaadaan oo ay i caayaane. Laakiinse kii
hubka u siday wuu diiday, waayo, aad buu u cabsaday. Sidaas
daraaddeed Saa'uul wuxuu qaatay seeftiisii, markaasuu ku
dul dhacay. 5 Oo kii hubka u sidayna markuu arkay in Saa'uul
dhintay isna wuxuu ku dul dhacay seeftiisii, wuuna dhintay.
6 Sidaas daraaddeed waxaa wada dhintay Saa'uul iyo
saddexdiisii wiil, oo reerkiisii oo dhammu way wada dhinteen.
7 Oo raggii reer binu Israa'iil oo dooxada joogay oo dhammu
markay arkeen inay iyagu carareen, oo Saa'uul iyo wiilashiisii
ay dhinteen ayay magaalooyinkoodii ka tageen, oo carareen,
markaasaa reer Falastiin yimaadeen oo iska degeen. 8
Oo maalintii dambe markay reer Falastiin u yimaadeen
inay dharka ka furtaan kuwii la dilay waxay heleen Saa'uul
iyo wiilashiisii oo Buur Gilboca ku dhintay. 9 Markaasay
furteen oo waxay qaateen madaxiisii iyo hubkiisii, oo waxay
u cid direen dalkii reer Falastiin oo ku wareegsanaa inay u
wargeeyaan sanamyadooda iyo dadkiiba. 10 Oo hubkiisiina
gurigii ilaahyadooda ayay dhigeen, oo madaxiisiina waxay ku
dhejiyeen gurigii Daagoon. 11 Oo dadkii Yaabeesh Gilecaad
oo dhammu markay maqleen waxyaalihii ay reer Falastiin
Saa'uul ku sameeyeen oo dhan, 12 waxaa kacay raggii
xoogga lahaa oo dhan, oo waxay soo qaadeen Saa'uul
meydkiisii iyo meydadkii wiilashiisa, kolkaasay keeneen
Yaabeesh, oo lafahoodii waxay ku aaseen geedkii Yaabeesh
ku yiil hoostiisa, toddoba maalmoodna way soomeen. 13
Haddaba Saa'uul wuxuu u dhintay xadgudubkiisii uu isagu
Rabbiga ku xadgudbay, maxaa yeelay, isagu Eraygii Rabbiga
ma uu dhawrin, oo weliba isagu wuxuu talo weyddiistay
mid ruuxaan lahayd, si uu iyada wax u weyddiisto, 14
oo Rabbiga wax ma uu weyddiisan, oo sidaas aawadeed
ayaa Rabbigu isaga u dilay, oo boqortooyadiina wuxuu u
wareejiyey Daa'uud oo ahaa ina Yesay.

**11** Markaasaa reer binu Israa'iil oo dhammu waxay Daa'uud
ugu soo shireen Xebroon, oo waxay ku yidhaahdeen,
Annagu waxaannu nahay laftaada iyo jidhkaaga. 2 Waagii
hore markii Saa'uul boqorka ahaa adiguu ahaa kii reer
binu Israa'iil dibadda u bixin jiray oo gudaha soo gelin
jiray, oo Rabbiga Ilaahaaga ahuna wuxuu kugu yidhi, Adigu
waxaad quudin doontaa dadkayga reer binu Israa'iil, oo amiir
baanad u ahaan doontaa dadkayga reer binu Israa'iil. 3
Sidaas aawadeed odayaashii reer binu Israa'iil oo dhammu
waxay boqorkii ugu yimaadeen Xebroon, oo Daa'uudna
wuxuu iyagii axdi kula dhigtay Xebroon Rabbiga hortiisa;
oo iyana waxay Daa'uud u boqreen inuu ahaado boqor
reer binu Israa'iil u taliya, siduu ahaa Eraygii Rabbiga oo
uu u soo dhiibay Samuu'eel. 4 Markaasaa Daa'uud iyo
reer binu Israa'iil oo dhammu waxay tageen Yeruusaalem

(taasoo ah Yebuus), oo halkaasna waxaa joogay dadkii
dalka degganaa oo ahaa reer Yebuus. **5** Markaasaa dadkii
Yebuus degganaa waxay Daa'uud ku yidhaahdeen, Adigu
halkan soo geli maysid. Habase yeeshee Daa'uud waa
qabsaday qalcaddii Siyoon, oo taasuna waa magaaladii
Daa'uud. **6** Markaasaa Daa'uud wuxuu yidhi, Ku alla kii
marka hore reer Yebuus laayaa wuxuu noqon doonaa madax
iyo sirkaal. Oo waxaa markii hore baxay Yoo'aab oo ay
Seruuyaah dhashay, oo isagii ayaa waxaa laga dhigay
madax. **7** Oo Daa'uudna qalcaddii ayuu degay, oo sidaas
daraaddeed waxaa loo bixiyey magaaladii Daa'uud. **8**
Oo wuxuu dhisay magaalada hareeraheedii, iyo tan iyo
Millo wareeggeeda. Oo Yoo'aabna wuxuu cusboonaysiiyey
magaalada inteedii kale. **9** Oo Daa'uudna aad iyo aad
buu u sii xoogaystay, waayo, waxaa isaga la jiray Rabbigii
ciidammada. **10** Haddaba kuwanu waa kuwii u horreeyey ee
nimankii xoogga badnaa oo Daa'uud haystay, kuwaasoo
ismuujiyey inay isaga iyo boqortooyadiisa aad iyo aad ula
jiraan si ay boqor uga dhigtaan iyadoo reer binu Israa'iil oo
dhammu ay la wada jiraan, siduu ahaa Eraygii Rabbiga oo
reer binu Israa'iil ku saabsanaa. **11** Oo tanuna waa tiradii
raggii xoogga badnaa oo Daa'uud haystay: Yaashaabcaam
oo ahaa reer Xakmoonii oo ahaa ka ugu horreeya soddonka,
isagu wuxuu warankiisa u qaaday saddex boqol oo nin,
oo isku mar buuna laayay. **12** Oo isaga dabadiisna waxaa
jiray Elecaasaar ina Doodoo, oo ahaa reer Axoo'ax, oo isna
wuxuu ahaa saddexdii nin oo xoogga badnaa midkood.
**13** Oo isagu wuxuu Daa'uud la joogay Fasdammiim, oo
halkaasna waxaa dagaal ugu soo ururay reer Falastiin,
meeshaas oo ahayd dhul beero ah oo shaciir ka buuxo, oo
dadkiina way ka carareen reer Falastiin hortooda. **14** Oo
beertii bay isdhex taageen oo daafaceen, wayna laayeen
reer Falastiin, oo Rabbiguna wuxuu iyagii ku badbaadiyey
guul weyn. **15** Oo soddonkii ugu horreeyey saddex ka mid
ah ayaa hoos ugu dhaadhacay dhagixii weynaa ee Daa'uud
joogay, oo waxay galeen godkii Cadullaam, oo ciidankii reer
Falastiinna waxay soo degeen dooxadii Refaa'iim. **16** Oo
markaas Daa'uud wuxuu ku jiray dhufayskii, oo ciidankii
reer Falastiin xeradooduna waxay ahayd Beytlaxam. **17** Oo
Daa'uudna intuu biyo u xiisooday ayuu yidhi, Waxaan jeclaan
lahaa in biyo layga siiyo ceelka Beytlaxam, ee iridda ku ag
yaal! **18** Markaasaa saddexdii ayaa dhex maray ciidankii
reer Falastiin, oo waxay biyo ka soo dhaamiyeen ceelkii
Beytlaxam ee iridda ku ag yiil, oo intay soo qaadeen ayay
Daa'uud u keeneen, laakiinse Daa'uud wuu diiday inuu cabbo
biyahaas, Rabbiguuse u daadshay. **19** Oo wuxuu yidhi,
Anigu inaan saas yeelo Ilaahaygu ha ii diido, ma waxaan
cabbaa dhiiggii nimankan naftooda biimeeyey? Waayo, iyagu
biyahan waxay ku keeneen naftoodii oo halis ku jirta. Sidaas
daraaddeed wuu diiday inuu cabbo. Oo saddexdii nin oo
xoogga badnaana saasay yeeleen. **20** Oo saddexdoodana
waxaa madax u ahaa Abiishay oo ahaa Yoo'aab walaalkiis,
waayo, isagu wuxuu warankiisa u qaaday saddex boqol oo
nin, wuuna laayay, saddexdiina magac buu ku lahaa. **21**
Oo isagu labada kaleba wuu ka ciso badnaa, oo waxaa
looga dhigay sirkaal, habase yeeshee saddexdii hore ma uu
gaadhin. **22** Benaayaah ina Yehooyaadaac, oo uu dhalay
nin xoog weyn oo reer Qabse'eel ahu, kaasoo sameeyey
falimo waaweyn wuxuu dilay labadii wiil oo Arii'eel kii reer
Moo'aab, oo haddana wuu tegay oo libaax buu god ku dhex
dilay wakhtiga barafka, **23** oo wuxuu kaloo dilay nin Masri ah
oo ahaa nin aad u dheer, oo dhererkiisuna wuxuu ahaa shan
dhudhun, oo Masriguna wuxuu gacanta ku haystay waran
le'eg dharsameeyaha looxiisa, oo isna wuxuu ula tegey
ul, oo warankii ka dhufsaday gacantii Masriga, oo isagii
ku dilay warankiisii. **24** Oo waxyaalahan waxaa sameeyey
Benaayaah oo ahaa ina Yehooyaadaac, oo isna saddexdii
nin ee xoogga badnaa magac buu ku lahaa. **25** Oo bal
eeg, isagu wuu ka ciso badnaa soddonka, laakiinse ma uu
gaadhin saddexdii hore, oo Daa'uudna wuxuu isaga madax
uga dhigay lataliyayaashiisii. **26** Oo weliba raggii ciidammada
ku jiray oo xoogga badnaa waxay ahaayeen Casaaheel oo
Yoo'aab walaalkiis ahaa, iyo Elxaanaan oo ahaa ina Doodoo
oo reer Beytlaxam ahaa, **27** iyo Shammood oo ahaa reer
Xarod, iyo Xeles oo ahaa reer Feloonii, **28** iyo Ciiraa ina
Ciqeesh oo ahaa reer Teqooca, iyo Abiiceser oo ahaa reer
Canaatood, **29** iyo Sibbekay oo ahaa reer Xushaad, iyo Ciilay
oo ahaa reer Axoo'ax, **30** iyo Maharay oo ahaa reer Netofaah,
iyo Xeeled ina Bacanaah oo ahaa reer Netofaah, **31** iyo Iitay
ina Riibay oo ahaa reer Gibecaah oo qoladiisu ahayd reer
Benyaamiin, iyo Benaayaah oo ahaa reer Fircaatoon, **32**
iyo Xuuray oo ka yimid durdurradii Gacash, iyo Abii'eel oo
ahaa reer Caraabaah, **33** iyo Casmaawed oo ahaa reer
Baxuuriim, iyo Elyaxbaa oo ahaa reer Shacalbiim, **34** iyo
ina Haasheem oo ahaa reer Gisonii, iyo Yoonaataan ina
Shaagee oo ahaa reer Haraarii, **35** iyo Axiyaam oo ahaa
ina Saakaar oo ahaa reer Haraarii, iyo Eliifaal oo ahaa ina
Uur, **36** iyo Heefer oo ahaa reer Mekeeraatii, iyo Axiiyaah oo
ahaa reer Feloonii, **37** iyo Xesroo oo ahaa reer Karmel, iyo
Nacaray oo ahaa ina Esbay, **38** iyo Yoo'eel oo ahaa Naataan
walaalkiis, iyo Mibxaar oo ahaa ina Hagrii, **39** iyo Seleq oo
ahaa reer Cammoon, iyo Naxaray oo ahaa reer Beerod, oo
ahaa kii gaashaanka u qaadi jiray Yoo'aab oo ay Seruuyaah
dhashay, **40** iyo Ciiraa oo ahaa reer Yeter, iyo Gaareeb oo

ahaa reer Yeter, **41** iyo Uuriyaah oo ahaa reer Xeed, iyo
Soobaad oo ahaa ina Axlay, **42** iyo Cadiinaa oo ahaa ina
Shiisaa oo ahaa reer Ruubeen, oo weliba madax u ahaa
reer Ruubeen iyo soddon isaga la jirtay, **43** iyo Xaanaan oo
ahaa ina Macakaah, iyo Yooshaafaad oo ahaa reer Mitnii,
**44** iyo Cusiyaa oo ahaa reer Cashteraatii, iyo Shamac, iyo
Yecii'eel oo ahaa wiilashii Xootaam oo ahaa reer Carooceer,
**45** iyo Yediica'eel oo ahaa ina Shimrii, iyo Yooxaa oo ahaa
isaga walaalkiis oo qoladoodu ahayd reer Tiisii, **46** iyo Elii'eel
oo ahaa reer Maxawiim, iyo Yeriibay, iyo Yooshawiyaah oo
ahaa wiilashii Elnacam, iyo Yitmaah oo ahaa reer Moo'aab,
**47** iyo Elii'eel, iyo Coobeed, iyo Yacasii'eel oo ahaa reer
Mesobaayaah.

**12** Haddaba intanu waa kuwii Daa'uud ugu yimid Siiqlag,
intuu weli ka dhumanayay Saa'uul ina Qiish, oo iyagu
waxay ku jireen ragga xoogga badan oo la dagaal galay. **2**
Oo iyagu qaansooyin bay siteen, oo gacanta midigta iyo tan
bidixdaba dhagaxyo way ku wadhfin kareen, fallaadhona
qaansooyin way kaga gani kareen, oo iyagu waxay ahaayeen
reer Benyaamiin oo Saa'uul walaalihiis ah. **3** Oo waxaa
madax ahaa Axiiceser, dabadeedna Yoo'aash, oo ahaa ina
Shemaacaah oo ahaa reer Gibecaad, iyo Yesii'eel iyo Feled
oo ahaa wiilashii Casmaawed, iyo Beraakaah, iyo Yeehuu
oo ahaa reer Canaatood, **4** iyo Yishmacyaah oo ahaa reer
Gibecoon oo ahaa nin xoog badan oo soddonka ka mid ahaa,
oo weliba soddonka ka wada sarreeyey, iyo Yeremyaah, iyo
Yaxasii'eel, iyo Yooxaanaan, iyo Yoosaabaad oo ahaa reer
Gedeeraad, **5** iyo Elcuusay, iyo Yeriimood, iyo Becalyaah,
iyo Shemaryaah, iyo Shefatyaah oo ahaa reer Xaruuf, **6** iyo
Elqaanaah, iyo Yishiyaah, iyo Casareel, iyo Yooceser, iyo
Yaashaabcaam oo ahaa reer Qorax, **7** iyo Yooceelaah iyo
Sebadyaah oo ahaa wiilashii Yeroxaam oo ahaa reer Gedoor.
**8** Oo waxaa reer Gaad Daa'uud isaga soocay oo ugu tegey
dhufayskii cidlada ku yiil rag xoog badan oo ah rag dagaal
loo tababbaray, oo gaashaan iyo waran qaadan karay, oo
wejigooduna wuxuu ahaa sida weji libaax oo kale, oo waxay u
dheereeyeen sida cawsha buuraha joogta. **9** Oo iyaga waxaa
madax ahaa Ceser, Cobadyaahna wuxuu ahaa kii labaad,
Elii'aabna kii saddexaad, **10** Mishmannaahna kii afraad,
Yeremyaahna kii shanaad, **11** Catayna kii lixaad, Elii'eelna kii
toddobaad, **12** Yooxaanaanna kii siddeedaad, Elsaabaadna
kii sagaalaad, **13** Yeremyaahna kii tobnaad, Makbannayna
kii kow iyo tobnaad. **14** Kuwaas oo ahaa reer Gaad waxay
ahaayeen saraakiishii ciidanka, oo kii iyaga ugu yaraa wuxuu
u dhigmaa boqol nin, kii ugu weynaana kun nin. **15** Oo
kuwaasu waxay ahaayeen kuwii bishii kowaad ka gudbay
Webi Urdun oo buuxdhaafay oo qararka oo dhan ka daatay,
oo iyagu waxay kala eryeen dadkii dooxooyinka degganaa
oo dhan, xagga bari, iyo xagga galbeedba. **16** Oo waxaa
dhufayska Daa'uud ugu yimid reer Benyaamiin iyo reer
Yahuudah qaarkooda. **17** Markaasaa Daa'uud u baxay inuu
iyaga ka hor tago, oo intuu jawaabay ayuu ku yidhi, Haddaad
nabdoon iigu timaadeen inaad i caawisaan qalbigaygu wuu
idinla jiri doonaa, laakiinse haddaad iigu timaadeen inaad
cadaawayaashayda ii gacangelisaan, Ilaahii awowayaasheen
taas ha fiiriyo oo ha canaanto, maxaa yeelay, gacmahayga
wax xumaan ahu kuma jiraan. **18** Markaasaa ruuxii ku soo
degay Camaasay oo soddonkii nin madax u ahaa, oo wuxuu
yidhi, Daa'uudow, ina Yesayow, annagu waxaannu nahay
kuwaagii, waannuna ku garab taagan nahay. Nabad. Nabad
ha kula jirto, oo kaalmeeyayaashaadana nabad ha la jirto,
waayo, waxaa ku caawiya Ilaahaaga. Markaasaa Daa'uud
iyagii soo dhoweeyey oo wuxuu ka dhigay saraakiishii
guutada. **19** Oo weliba reer Manasehna qaar baa Daa'uud
geestiisa soo maray markuu raacay reer Falastiin oo Saa'uul
dagaal ugu yimid, laakiinse iyagii ma ay caawiyin, waayo,
saraakiishii reer Falastiin talay isagii ku eryeen, oo waxay
isyidhaahdeen, Isagu intuu madaxyadeenna khatar geliyo
ayuu sayidkiisii Saa'uul garab geli doonaa. **20** Oo markuu
Siiqlag tegey waxaa geestiisa reer Manaseh ka soo maray
Cadnaah, iyo Yoosaabaad, iyo Yediica'eel, iyo Miikaa'eel, iyo
Yoosaabaad, iyo Eliihuu, iyo Silletay, oo dhammaantood
ahaa saraakiil u taliya kun kun reer Manaseh ah. **21** Oo
waxay Daa'uud ka caawiyeen guutadii wax dhacaysay,
waayo, waxay ahaayeen rag xoog badan oo ahaa saraakiishii
ciidanka. **22** Waayo, maalin ka maalin waxaa Daa'uud u
iman jiray kuwo isaga caawiya, ilamaa ay noqdeen ciidan
weyn, oo ah sidii ciidanka Ilaah. **23** Oo tanuna waa tiradii
kuwii madaxda u ahaa kuwii dagaalka hubka u lahaa, oo
Daa'uud ugu yimid Xebroon inay boqortooyada Saa'uul
isaga u rogaan sidii uu eraygii Rabbigu ahaa. **24** Kuwii
reer Yahuudah ee gaashaan iyo waran qaadayay waxay
ahaayeen lix kun iyo siddeed boqol oo nin, oo dagaal hub
u leh. **25** Oo kuwii reer Simecoon ee xoogga badnaa,
dagaalkana u darbanaa waxay ahaayeen toddoba kun iyo
boqol. **26** Reer Laawina waxaa ka joogay afar kun iyo
lix boqol. **27** Oo Yehooyaadaacna wuxuu ahaa madaxdii
reer Haaruun, oo isagana waxaa la socday saddex kun
iyo toddoba boqol oo nin. **28** Saadooqna wuxuu ahaa nin
dhallinyar oo xoog badan, oo waxaa la jiray laba iyo labaatan
sirkaal oo reerkiisii wada ah. **29** Oo reer Benyaamiin oo ahaa
Saa'uul walaalihiisna waxaa ka joogay saddex kun oo nin,
waayo, ilaa waagaas iyaga intoodii badnayd waxay daacad

u sii ahaayeen reerkii Saa'uul. 30 Oo reer Efrayimna waxaa
ka joogay labaatan kun iyo siddeed boqol oo nin, oo ah rag
xoog badan oo dhammaantood reerahooda caan ku ah. 31
Oo reer Manaseh badhkiisiina waxaa ka joogay siddeed iyo
toban kun oo nin, oo loo magacaabay inay yimaadaan oo ay
Daa'uud boqraan. 32 Oo reer Isaakaarna waxaa ka joogay
rag garasho u leh wakhtiyada iyo waxa reer binu Israa'iil
waajibka ku ah inay sameeyaan, oo iyaga madaxdoodu
waxay ahaayeen laba boqol oo nin oo walaalahood oo
dhanna iyagaa xukumay. 33 Oo reer Sebulunna waxaa ka
joogay kuwo ciidanka geli kara oo dagaalka isu safi kara,
iyagoo wata cayn kasta oo ah alaabta dagaalka, oo isdiyaarin
kara, oo aan labaqalbiilayaal ahayn, oo tiradooduna waxay
ahayd konton kun oo nin. 34 Oo reer Naftaalina waxaa ka
joogay kun sirkaal oo ay la socdaan toddoba iyo soddon kun
oo nin oo waran iyo gaashaan wada sita. 35 Oo reer Daanna
waxaa ka joogay siddeed iyo labaatan kun iyo lix boqol
oo nin oo dagaalka isu safi kara. 36 Oo reer Aasheerna
waxaa ka joogay afartan kun oo nin oo ciidanka geli kara oo
dagaalka isu safi kara. 37 Oo Webi Urdun dhankiisa kalena
waxaa ka yimid boqol iyo labaatan kun oo nin oo wata
cayn kasta oo ah alaabta dagaalka, oo waxayna ahaayeen
reer Ruubeen, iyo reer Gaad, iyo reer Manaseh badhkiis.
38 Intaas oo dhan oo wada ahaa rag dagaalyahan ah oo
dagaalka isu safi kara waxay Xebroon ula yimaadeen qalbi
qumman inay Daa'uud reer binu Israa'iil oo dhan u boqraan,
oo reer binu Israa'iil intooda hadhay oo dhammuna isku
qalbi bay ku ahaayeen inay Daa'uud boqraan. 39 Oo iyana
halkaasay Daa'uud la joogeen intii saddex maalmood ah,
iyagoo wax cunaya oo wax cabbaya, waayo, walaalahood
baa sooryo u diyaariyey. 40 Oo weliba dadkii iyaga u dhowaa
ee ahaa ilaa reer Isaakaar iyo reer Sebulun iyo reer Naftaali
waxay cunto ku soo rareen dameerro, iyo awr, iyo baqlo,
iyo dibi, oo waxay keeneen bur, iyo fudad berde ah, iyo
rucubo sabiib ah, iyo khamri, iyo saliid, iyo dibi, iyo ido,
dhammaanna aad iyo aad bay u badnaayeen, maxaa yeelay,
reer binu Israa'iil dhexdooda farxad baa jirtay.

13 Markaasaa Daa'uud wuxuu la arrinsaday saraakiishii
kun kun u taliyey iyo kuwii boqol boqol u taliyey iyo
xataa hoggaamiye kasta. 2 Markaasaa Daa'uud wuxuu
shirkii reer binu Israa'iil oo dhan ku yidhi, Hadday idinla
wanaagsan tahay iyo hadday tahay tan Rabbiga Ilaaheenna
ah aynu meel kasta ugu cid dirno walaalaheenna ku hadhay
dalka Israa'iil oo dhan, kuwaasoo ah kuwa wadaaddada iyo
reer Laawi ay la dhex joogaan magaalooyinkooda agagaarka
leh, si ay iyaguna inoogu soo ururaan. 3 Oo weliba aynu
sanduuqii Ilaaheenna mar kale soo ceshanno, waayo, isagii
waynu iska daynay wakhtigii Saa'uul noolaa. 4 Markaasaa
shirkii oo dhammu waxay yidhaahdeen, Haah, oo sidaasaynu
yeelaynaa, maxaa yeelay, taasu dadkii oo dhan ayay la
qummanayd. 5 Markaasuu Daa'uud soo wada shiriyey reer
binu Israa'iil oo dhan, oo wuxuu ka soo ururiyey tan iyo
Shiixoor oo ah durdurka Masar iyo xataa tan iyo meesha
Xamaad laga galo in sanduuqii Ilaah Qiryad Yecaariim laga
soo qaado. 6 Markaasaa Daa'uud iyo reer binu Israa'iil oo
dhammu waxay tageen Bacalaah, oo ah Qiryad Yecaariim,
oo ay reer Yahuudah iska leeyihiin, inay halkaas ka soo
qaadaan sanduuqii Ilaah oo ah meesha Rabbiga Keruubiimta
kala dhex fadhiya magiciisa lagu baryo. 7 Oo sanduuqii
Ilaah gaadhi cusub bay saareen, markay ka soo bixiyeen
gurigii Abiinaadaab, oo gaadhigiina waxaa waday Cuusaa
iyo Axiyoo. 8 Oo Daa'uud iyo reer binu Israa'iil oo dhammu
waxay Ilaah hortiis ku cayaareen xooggooda oo dhan, oo
gabayo, iyo kataarado, iyo shareerado, iyo dafaf, iyo suxuun
laysku garaaco, iyo turumbooyin ayay ku cayaareen. 9 Oo
markay yimaadeen meeshii hadhuudhka lagu tumi jiray oo
Kiidon ayaa Cuusaa gacanta fidiyey si uu u qabto sanduuqii,
waayo, dibidii sidday ayaa turunturootay. 10 Markaasaa
Rabbigu aad ugu cadhooday Cuusaa, wuuna dilay, maxaa
yeelay, isagu wuxuu gacanta ku fidiyey sanduuqa, oo
halkaasuu ku dhintay Ilaah hortiisa. 11 Oo Daa'uudna taas
buu ka xumaaday, maxaa yeelay, Rabbigu degdeg buu u
qabtay Cuusaa, oo meeshaas magaceedii wuxuu u bixiyey
Feres Cuusaa, oo ilaa maantadanna waa la yidhaahdaa. 12
Oo Daa'uudna maalintaas wuu ka baqay Ilaah, oo wuxuu
isyidhi, Sanduuqa Ilaah bal sidee baan magaaladayda u
geeysanayaa? 13 Sidaas daraaddeed Daa'uud sanduuqii
ma geeyn magaaladiisii, laakiinse gees buu ugu leexshay
gurigii Cobeed Edoom kii reer Gad. 14 Oo saddex bilood
ayaa sanduuqii Ilaah gurigii Cobeed Edoom xaaskiisa la yiil,
oo Rabbiguna wuu barakeeyey Cobeed Edoom reerkiisii iyo
wixii uu haystay oo dhan.

14 Markaasaa Xiiraam oo ahaa boqorkii Turos ayaa
Daa'uud wargeeyayaal u soo diray, iyo geedo kedar
la yidhaahdo, iyo wastaadyo, iyo nijaarro, inay guri u
dhisaan. 2 Oo Daa'uud wuxuu ogaaday in Rabbigu isaga u
taagay inuu ahaado boqor u taliya reer binu Israa'iil, waayo,
boqortooyadiisii waa la sarraysiiyey dadkiisa reer binu Israa'iil
aawadood. 3 Oo Daa'uudna naago kale buu Yeruusaalem
ku guursaday, oo wuxuu dhalay wiilal iyo gabdho kale. 4
Oo carruurtii Yeruusaalem ugu dhalatay magacyadoodiina
waa kuwan: Shammuuca, iyo Shoobaab, iyo Naataan, iyo
Sulaymaan, 5 iyo Yibxaar, iyo Eliishuuca, iyo Elfaaled, 6

iyo Nogah, iyo Nefeg, iyo Yaafiica, 7 iyo Eliishaamaac, iyo
Becelyaadaac, iyo Eliifeled. 8 Oo reer Falastiinna markay
maqleen in Daa'uud loo subkay inuu boqor u ahaado reer
binu Israa'iil oo dhan ayay reer Falastiin oo dhammu u soo
baxeen inay Daa'uud doondoonaan, oo Daa'uudna taas
wuu maqlay, oo isna iyagii ayuu ku baxay. 9 Haddaba reer
Falastiin way yimaadeen, oo waxay ku firdheen dooxadii
Refaa'iim. 10 Markaasaa Daa'uud Rabbiga wax weyddiiyey
oo yidhi, Miyaan reer Falastiin ku kacaa? Miyaad ii soo
gacangelinaysaa? Markaasaa Rabbigu wuxuu ku yidhi,
Haah, ku kac, waayo, iyaga waan kuu soo gacangelinayaa.
11 Hadda waxay yimaadeen Bacal Feraasiim, oo halkaasaa
Daa'uud iyagii ku laayay, oo Daa'uud wuxuu yidhi, Rabbigu
cadaawayaashaydii ayuu gacantayda degdeg ugu qabtay,
sida biyaha butaacayaa u degdegaan oo kale. Sidaas
daraaddeed meeshaas magaceedii waxaa loo bixiyey Bacal
Feraasiim. 12 Iyana halkaasay ilaahyadoodii kaga tageen,
markaasaa Daa'uud amar ku bixiyey in la gubo. 13 Haddana
reer Falastiin mar kalay dooxadii ku soo firdheen. 14 Oo
Daa'uudna mar kaluu Rabbiga wax weyddiiyey, oo Ilaahna
wuxuu ku yidhi, Waa inaanad ka daba kicin, laakiinse iyaga
ka leexo, oo waxaad ku weerartaa meel ka soo hor jeedda
geedaha bukaa la yidhaahdo. 15 Oo markaad sanqadha
askarta socodkeeda ka maqashid geedaha bukaa dushooda,
markaas dagaalka hore ugu bax, waayo, Ilaah waa kaaga hor
baxay inuu ciidanka reer Falastiin laayo. 16 Oo Daa'uudna
wuxuu yeelay sidii Ilaah ku amray, oo waxay ciidankii reer
Falastiin ku laynayeen ilaa Gibecoon iyo tan iyo Geser. 17
Oo Daa'uud warkiisiina wuxuu gaadhay dalalka oo dhan, oo
Rabbiguna cabsi isaga ka timid ayuu ku riday quruumihii
kale oo dhan.

**15** Markaasaa Daa'uud wuxuu magaaladii Daa'uud ka
dhistay guryo, oo sanduuqii Ilaahna meel buu u
hagaajiyey, teendhona buu u dhisay. 2 Markaasaa Daa'uud
yidhi, Waa inaan ninna qaadin sanduuqa Ilaah reer Laawi
mooyaane, waayo, Rabbigu iyaguu u doortay inay qaadaan
sanduuqa Ilaah, iyo inay isaga u adeegaan weligood. 3
Oo Daa'uud reer binu Israa'iil oo dhan wuxuu ku soo
wada ururiyey Yeruusaalem in sanduuqii Rabbiga la keeno
meeshiisii uu u hagaajiyey. 4 Oo haddana Daa'uud wuxuu
soo wada ururiyey reer Haaruun iyo reer Laawi. 5 Kuwii
reer Qohaad waxay ahaayeen Uurii'eel oo madax ahaa,
iyo walaalihiis oo ahaa boqol iyo labaatan nin, 6 kuwii reer
Meraariina, Casaayaah oo madax ahaa, iyo laba boqol iyo
labaatan nin oo walaalihiis ahaa, 7 kuwii reer Gershoomna,
Yoo'eel oo madax ahaa, iyo boqol iyo soddon nin oo
walaalihiis ahaa, 8 kuwii reer Eliisaafaanna, Shemacyaah
oo madax ahaa, iyo laba boqol oo nin oo walaalihiis
ahaa, 9 kuwii reer Xebroonna, Elii'eel oo madax ahaa, iyo
siddeetan nin oo walaalihiis ahaa, 10 kuwii reer Cusii'eelna,
Cammiinaadaab oo madax ahaa, iyo boqol iyo laba iyo toban
nin oo walaalihiis ahaa. 11 Markaasaa Daa'uud u yeedhay
Saadooq iyo Aabyaataar oo wadaaddada ahaa, iyo kuwii
reer Laawi oo ahaa Uurii'eel, iyo Casaayaah, iyo Yoo'eel, iyo
Shemacyaah, iyo Elii'eel, iyo Cammiinaadaab, 12 oo wuxuu
ku yidhi, Idinku waxaad tihiin madaxdii qolooyinka reer Laawi,
haddaba idinka iyo walaalihiinba isdaahiriya si aad sanduuqii
Rabbiga ah Ilaaha reer binu Israa'iil ugu soo qaaddaan
meeshii aan u hagaajiyey. 13 Maxaa yeelay, indinku markii
hore ma aydnaan qaadin, oo sidaas daraaddeed ayaa
Rabbiga Ilaaheenna ahu degdeg inoogu qabtay, waayo, sidii
qaynuunku ahaa wax kuma aynan weyddiin. 14 Haddaba
sidaas daraaddeed ayaa wadaaddadii iyo kuwii reer Laawi
isdaahiriyeen inay soo qaadaan sanduuqii Rabbiga ah Ilaaha
reer binu Israa'iil. 15 Markaasaa reer Laawi garbaha ku
qaadeen sanduuqii Ilaah iyagoo ulihiisii ku sida, sidii Muuse
amray oo uu eraygii Rabbigu ahaa. 16 Markaasaa Daa'uud
madaxdii reer Laawi ku yidhi, Walaalihiin rag ka dhex
doorta inay ahaadaan niman gabayaa ah oo sita alaabtii
muusikada, oo ah shareerado, iyo kataarado, iyo suxuun
laysku garaaco, oo aad ha uga dhawaajiyeen oo farxad
aawadeed codka kor ha u qaadeen. 17 Sidaas daraaddeed
reer Laawi waxay doorteen Heemaan oo ahaa ina Yoo'eel iyo
walaalihiis oo ahaa Aasaaf ina Berekyaah, oo walaalahood
reer Meraariina waxay ka doorteen Eetaan ina Quushaayaah,
18 oo iyaga waxaa la jiray walaalahood oo ahaa darajadii
labaad, waxayna ahaayeen Sekaryaah, iyo Been, iyo
Yacasii'eel, iyo Shemiiraamood, iyo Yexii'eel, iyo Cunnii, iyo
Elii'aab, iyo Benaayaah, iyo Macaseeyaah, iyo Matityaah, iyo
Eliifeleehuu, iyo Miqneeyaah, iyo Cobeed Edoom, iyo Yecii'eel
oo dhammaantood wada ahaa iridjoogayaal. 19 Sidaas
daraaddeed kuwii gabayaagii ahaa oo ahaa Heemaan, iyo
Aasaaf, iyo Eetaan waxay siteen suxuun naxaas ah oo laysku
garaaco si ay aad ugaga dhawaajiyaan, 20 oo Sekaryaah,
iyo Casii'eel, iyo Shemiiraamood iyo Yexii'eel, iyo Cunnii,
iyo Elii'aab, iyo Macaseeyaah, iyo Benaayaahna waxay
siteen shareerado si ay ugu dhuftaan wax Calaamood lagu
luuqeeyo, 21 oo Matityaah, iyo Eliifeleehuu, iyo Miqneeyaah,
iyo Cobeed Edoom, iyo Yecii'eel, iyo Casasyaahna waxay
siteen kataarado ay ku hoggaamiyaan wax Shemiiniid lagu
luuqeeyo. 22 Oo Kenanyaah oo madax u ahaa reer Laawina
wuxuu u sarreeyey gabaygii, oo isagu wuxuu dadkii wax
ka baray gabaygii, maxaa yeelay, aad buu u yiqiin. 23

Oo Berekyaah iyo Elqaanaahna waxay iridjoogayaal u
ahaayeen sanduuqii. 24 Oo wadaaddadii ahaa Shebanyaah,
iyo Yehooshaafaad, iyo Netaneel, iyo Camaasay, iyo
Sekaryaah, iyo Benaayaah, iyo Eliiceserna turumbooyin
ayay ku hor afuufayeen sanduuqii Ilaah, oo Cobeed Edoom
iyo Yexiyaahna iridjoogayaal ayay sanduuqii u ahaayeen. 25
Sidaas daraaddeed Daa'uud iyo odayaashii reer binu Israa'iil
iyo kuwii kun kun u taliyeyba waxay u tageen inay sanduuqii
axdiga Rabbiga ka soo qaadaan gurigii Cobeed Edoom
iyagoo faraxsan. 26 Oo markii Ilaah caawiyey kuwii reer
Laawi oo qaaday sanduuqii axdiga Rabbiga ayay toddoba
dibi iyo toddoba wan ku allabaryeen. 27 Oo Daa'uudna
wuxuu xidhnaa dhar aad u wanaagsan, isaga iyo kuwii reer
Laawi oo sanduuqa qaaday oo dhan, iyo nimankii gabayaaga
ahaa, iyo Kenanyaah oo ahaa madaxdii gabayga oo la
jiray nimankii gabayaaga ahaa, oo Daa'uudna wuxuu qabay
eefod maro wanaagsan ah. 28 Haddaba reer binu Israa'iil oo
dhammu saasay u soo qaadeen sanduuqii axdiga Rabbiga
iyagoo dhawaaqaya, oo afuufaya buun iyo turumbooyin, oo
ka dhawaajinaya suxuun laysku garaaco, iyo shareerado
iyo kataarado. 29 Oo markii sanduuqii axdiga Rabbigu
uu magaaladii Daa'uud imanayay ayay Miikaal oo ahayd
ina Saa'uul daaqadda ka eegtay, oo kolkay aragtay Boqor
Daa'uud oo cayaaraya ayay qalbiga ka quudhsatay.

**16** Oo iyana sanduuqii Ilaah gudahay soo geliyeen, oo
dhex dhigeen teendhadii Daa'uud u dhisay, oo waxay
Ilaah hortiisa ku bixiyeen qurbaanno la gubo iyo qurbaanno
nabaadiino. 2 Oo Daa'uudna markuu dhammeeyey qurbaankii
la gubayay iyo qurbaannadii nabaadiinada ee uu bixinayay
ayuu dadkii ugu duceeyey magicii Rabbiga. 3 Oo markaasuu
reer binu Israa'iil oo dhan, nin iyo naagba, mid kasta
siiyey xabbad kibis ah, iyo cad hilib ah, iyo fud sabiib
ah. 4 Oo kuwii reer Laawi qaarkoodna wuxuu u doortay
inay ka adeegaan sanduuqa Rabbiga hortiisa, iyo inay
xusuustaan oo ku mahadnaqaan oo ammaanaan Rabbiga
ah Ilaaha reer binu Israa'iil, 5 kuwaasoo ahaa Aasaaf oo
kii kowaad ahaa, iyo Sekaryaah oo ahaa kii labaad, iyo
Yecii'eel, iyo Shemiiraamood, iyo Yexii'eel, iyo Matityaah, iyo
Elii'aab, iyo Benaayaah, iyo Cobeed Edoom, iyo Yecii'eel
oo haysan jiray shareerado iyo kataarado, oo Aasaafna
wuxuu aad uga dhawaajin jiray suxuun laysku garaaco.
6 Oo Benaayaah iyo Yaxasii'eel oo wadaaddo ahaana
turumbooyin ayay had iyo goorba ku haysan jireen sanduuqii
axdiga Ilaah hortiisa. 7 Oo maalintaas ayaa Daa'uud markii
ugu horraysay ku amray inay Aasaaf iyo walaalihiis Rabbiga
ku mahadnaqaan. 8 Rabbiga ku mahadnaqa, oo magiciisa
ku barya, Falimihiisana dadyowga ka dhex sheega. 9 Isaga
u gabya, oo ammaan ugu gabya, Shuqulladiisa yaabka
badan oo dhanna ka hadla. 10 Ku faana magiciisa quduuska
ah, Kuwa Rabbiga doondoona qalbigoodu ha reyreeyo. 11
Rabbiga iyo xooggiisa doondoona, Oo weligiinba wejigiisa
doondoona. 12 Xusuusta shuqulladiisii yaabka badnaa oo
uu sameeyey, Iyo cajaa'ibyadiisii iyo xukummadii afkiisa,
13 Kuwiinna farcanka addoonkiisii Israa'iilow, Kuwiisa uu
doortay oo reer Yacquub ahow. 14 Isagu waa Rabbiga
Ilaaheenna ah, Xukummadiisiina waxay ku jiraan dhulka
oo dhan. 15 Bal idinku weligiin xusuusta axdigiisa, Kaasoo
ah hadalkiisii uu dadkii kun qarni ku amray; 16 Kaasu waa
axdigii uu Ibraahim la dhigtay, Oo uu Isxaaq ugu dhaartay,
17 Oo isla kaas wuxuu u adkeeyey oo qaynuun uga dhigay
Yacquub, Oo Israa'iilna wuxuu uga dhigay axdi weligiis jiraya,
18 Oo wuxuu ku yidhi, Dalka Kancaan waxaan kuu siinayaa
Inuu ahaado qaybtii dhaxalkiinna, 19 Markaad dad tiro yar
ahaydeen, Oo aad aad u yaraydeen, qariibna dalka ku
ahaydeen. 20 Oo iyaguna quruunba quruun bay uga baxeen.
Oo intay boqortooyo ka tageen ayay dad kale u gudbeen.
21 Isagu ninna uma oggolaanin inuu wax yeelo, Haah, oo
daraaddood ayuu boqorro u canaantay, 22 Oo wuxuu ku
yidhi, Ha taabanina kuwayga subkan, Oo nebiyadaydana
waxba ha yeelina. 23 Dadka dhulka oo dhammow, Rabbiga
u gabya, Oo badbaadintiisana muujiya maalin ka maalin.
24 Ammaantiisana quruumaha dhexdooda ka sheega, Oo
shuqulladiisa yaabka badanna dadyowga oo dhan ka dhex
sheega. 25 Waayo, Rabbigu waa weyn yahay, waana mudan
yahay in aad loo ammaano, Isaga waa in laga cabsado
in ka sii badan ilaahyada oo dhan. 26 Waayo, dadyowga
ilaahyadooda oo dhammu waa sanamyo, Laakiinse Rabbigu
isagaa sameeyey samooyinka. 27 Sharaf iyo haybaduba
hortiisay yaalliin, Xoog iyo farxaduna meeshiisay ku jiraan. 28
Dadka qolooyinkiisow, Rabbiga ammaana, Waxaad Rabbiga
ka sheegtaan ammaan iyo xoog. 29 Waxaad Rabbiga ka
sheegtaan ammaanta magiciisu mudan yahay, Qurbaan u
keena, oo hortiisa kaalaya, Rabbiga ku caabuda quruxda
quduusnimada, 30 Dadka dhulka oo dhammow, hortiisa ku
gariira. Duniduna waxay u dhisan tahay si aan la dhaqaajin
karin. 31 Haddaba samooyinku ha farxeen, dhulkuna ha
reyreeyo, Oo quruumaha dhexdooda ha laga yidhaahdo,
Rabbigu waa boqor. 32 Badda iyo waxa ka buuxaba ha
guuxeen, Berriga iyo waxa ku jira oo dhammuna ha farxeen,
33 Oo markaasay dhirta duurka Rabbiga hortiisa ku gabyi
doonaan farxad daraaddeed, Waayo, isagu waa u imanayaa
inuu dhulka xukumo. 34 Rabbiga ku mahadnaqa, waayo,
isagu waa wanaagsan yahay, Oo naxariistiisuna way sii

waartaa weligeedba. 35 Oo waxaad tidhaahdaan, Ilaaha
badbaadadayadow, Na badbaadi, Oo na soo wada ururi
oo quruumahana naga samatabbixi, Si aannu magacaaga
quduuska ah ugu mahadnaqno, Oo aannu ammaantaada
ugu guulaysanno. 36 Waxaa mahad leh Rabbiga ah Ilaaha
reer binu Israa'iil, Tan iyo weligiis iyo weligiisba. Markaasaa
dadkii oo dhammu waxay yidhaahdeen, Aamiin, oo Rabbigay
ammaaneen. 37 Kolkaasuu halkaas sanduuqii axdiga
Rabbiga hortiisa kaga tegey Aasaaf iyo walaalihiis inay
had iyo goor ka adeegaan sanduuqa hortiisa sidii maalin
walba shuqulkeeda loo doonayay, 38 isaga iyo Cobeed
Edoom oo ay la jiraan siddeed iyo lixdan nin oo walaalahood
ah, oo weliba Cobeed Edoom oo ahaa ina Yeduutuun iyo
Xosaahna wuxuu uga tegey inay ahaadaan iridjoogayaal. 39
Oo wadaadkii Saadooq iyo wadaaddadii walaalihiis ahaana
wuxuu kaga hor tegey taambuuggii Rabbiga oo ku yiil meeshii
sare oo Gibecoon, 40 in had iyo goor subax iyo habeenba
meeshii qurbaanka la gubo ay Rabbiga ugu dul bixiyaan
qurbaanno la gubo kuwaasoo ahaa sidii dhammaan waxa ku
qoran sharciga Rabbiga, oo uu reer binu Israa'iil ku amray.
41 Oo wuxuu kaloo la reebay Heemaan iyo Yeduutuun iyo
kuwii kaloo la doortay oo loo magacaabay inay Rabbiga ku
mahadnaqaan, maxaa yeelay, naxariistiisu weligeedba way
waartaa. 42 Oo waxaa iyaga la jiray Heemaan iyo Yeduutuun
oo haystay turumbooyin iyo suxuun laysku garaaco oo ay
leeyihiin kuwa aad wax uga dhawaajiya, iyo alaabtii lagu
qaadi jiray gabayadii Ilaah, oo ilma Yeduutuunna wuxuu
kaga tegey inay iridda joogaan. 43 Markaasaa dadkii oo
dhan qof waluba gurigiisii tegey, oo Daa'uudna wuxuu u
noqday inuu reerkiisii u duceeyo aawadeed.

**17** Oo waxay noqotay markii Daa'uud gurigiisii degay, in
Daa'uud Nebi Naataan ku yidhi, Bal eeg, anigu waxaan
degganahay guri qori kedar ah laga sameeyey, laakiinse
sanduuqii axdiga Rabbigu wuxuu yaal daahyo hoostood. 2
Markaasaa Naataan wuxuu Daa'uud ku yidhi, Wax alla wixii
qalbigaaga ku jira oo dhan samee, waayo, Ilaah baa kula
jira. 3 Oo isla habeenkaas eraygii Ilaah baa u yimid Naataan
oo ku yidhi, 4 Tag, oo waxaad addoonkayga Daa'uud ku
tidhaahdaa, Rabbigu wuxuu ku leeyahay, Waxba guri aan
dego ha ii dhisin, 5 waayo, guri ma degin ilaa maalintii aan
reer binu Israa'iil soo bixiyey iyo tan iyo maantadan, laakiinse
teendhaba teendho kalaan uga bixi jiray oo taambuugna mid
kalaan uga bixi jiray. 6 Oo meel kasta oo aan kula socday
reer binu Israa'iil oo dhan, xaakinnadii reer binu Israa'iil
oo aan ku amray inay quudiyaan dadkayga ma midkood
baan eray kula hadlay, oo miyaan ku idhi, War maxaad
iigu dhisi weydeen guri kedar ah? 7 Haddaba waxaad
addoonkayga Daa'uud ku tidhaahdaa, Rabbiga ciidammadu
wuxuu leeyahay, Anaa kaa soo kaxeeyey xeradii idaha iyo
idihii aad raacaysay, inaad ahaatid amiir u taliya dadkayga
reer binu Israa'iil, 8 waanan kula jiray meel kastoo aad
tagtayba, oo cadaawayaashaadii oo dhanna hortaadaan ka
baabbi'iyey. Oo waxaan kuu bixin doonaa magac la mid ah
magacyada kuwa waaweyn oo dhulka jooga. 9 Oo dadkayga
reer binu Israa'iilna meel baan u dooran doonaa, oo waan
ku beeri doonaa, inay meeshooda degganaadaan oo ayan
mar dambe dhaqdhaqaaqin, ama ayan ilmaha sharku mar
dambe dhibin sidii markii hore, 10 iyo tan iyo maalintii
aan xaakinno ku amray inay dadkayga reer binu Israa'iil u
taliyaan. Cadaawayaashaada oo dhanna waan jebin doonaa.
Oo weliba waxaan kaloo kuu sheegayaa inuu Rabbigu reer
kuu yeeli doono. 11 Oo markii cimrigaagu dhammaado,
oo aad awowayaashaa la jiri doonto sida waajibka ah,
ayaan sara kicin doonaa farcankaaga kaa dambeeya oo
wiilashaada midkood ahaan doona, oo boqortooyadiisana
waan dhisi doonaa. 12 Oo isna guri buu ii dhisi doonaa, oo
xoog baan u yeeli doonaa carshigiisa weligiis. 13 Oo anigu
aabbaan u ahaan doonaa, isna wiil buu ii ahaan doonaa,
oo anna naxariistayda kama fogayn doono, sidii aan uga
fogeeyey kii kaa horreeyey, 14 laakiinse waxaan isaga dhex
taagi doonaa weligiisba gurigayga iyo boqortooyadayda, oo
carshigiisuna weligiis wuu dhisnaan doonaa. 15 Haddaba
siday erayadaas oo dhan iyo tusniintaas oo dhammu
ahaayeen ayaa Naataan kula hadlay Daa'uud. 16 Markaasaa
Boqor Daa'uud gudaha galay oo Rabbiga hor fadhiistay, oo
wuxuu yidhi, Rabbow Ilaahow, bal yaan ahay? Reerkayguna
waa maxay oo aad halkan ii soo gaadhsiisay? 17 Oo waxanu
hortaada wuu ku yaraa, Ilaahow, laakiinse waxaad kaloo ka
sii hadashay reerkaygu wuxuu wakhti dheer noqon doono,
anoo addoonkaaga ah, oo weliba Rabbow Ilaahow, waxaad
iiga fikirtay sidii nin darajo weyn leh. 18 Bal maxaan kaloo
kugu odhan karaa taasoo ku saabsan cisadii aad ii samaysay
anoo addoonkaaga ah? Waayo, waad i garanaysaa. 19
Rabbow, aniga daraadday, iyo qalbigaaga siduu yahay,
ayaad waxyaalahan waaweyn oo dhan u samaysay, inaad
waxyaalahan waaweyn oo dhan wada muujiso. 20 Rabbiyow,
mid kula mid ahu ma jiro, oo adiga mooyaane Ilaah kale
ma jiro, siday ahaayeen kulli wixii aannu dhegahayaga
ku maqalnay oo dhammu. 21 Bal quruuntee baa dunida
joogta oo la mid ah dadkaaga reer binu Israa'iil, kuwaasoo
adiga qudhaadu aad soo furatay inay dad kuu ahaadaan
iyo inaad magac isugu yeesho waxyaalo waaweyn oo
cabsi badan, markaad quruumaha ka eriday dadkaaga

hortiisa, kuwaasoo aad ka soo furatay dalkii Masar? 22
Waayo, dadkaaga reer binu Israa'iil waxaad ka dhigtay inay
dadkaaga ahaadaan weligood, oo Ilaahood baad noqotay,
Rabbiyow. 23 Haddaba Rabbow, eraygii aad ku hadashay
oo igu saabsanaa anoo addoonkaaga ah, oo ku saabsanaa
reerkayga, weligaa adkee oo sidaad ku hadashay yeel. 24
Oo magacaaguna ha xoogaysto oo ha weynaado weligiis,
hana la yidhaahdo, Rabbiga ciidammadu waa Ilaaha reer
binu Israa'iil, isagu wuxuu Ilaah u yahay reer binu Israa'iil, oo
anoo addoonkaaga Daa'uud ah reerkaygu hortaaduu ku
dhisan yahay. 25 Waayo, Ilaahayow, anoo addoonkaaga
ah wax baad ii muujisay, oo waxaad igu tidhi, Reer baan
kuu dhisi doonaa, sidaas daraaddeed waan ku dhiirranahay
inaan baryadan hortaada kugu baryo. 26 Haddaba Rabbiyow,
adigu waxaad tahay Ilaah, oo waxan wanaagsan baad ii
ballanqaadday, anoo addoonkaaga ah, 27 oo waxaad ku
faraxday inaad barakaysid reerkayga anoo addoonkaaga ah,
inuu weligiisba hortaada ku sii raago, waayo, Rabbiyow,
adigu waad barakaysay, oo wuu barakaysan yahay weligiis.

**18** Oo taas dabadeed ayaa Daa'uud reer Falastiin laayay
oo jebiyey, oo Gad iyo magaalooyinkeediiba gacantii
reer Falastiin wuu ka qaaday. 2 Oo wuxuu kaloo laayay
reer Moo'aab, oo reer Moo'aabna addoommay Daa'uud u
noqdeen, oo baad bay u keeneen. 3 Oo ilaa Xamaad Daa'uud
wuxuu dilayay boqorkii Soobaah oo ahaa Hadarceser, intuu
ku socday inuu dowladnimadiisa ku ag dhiso Webi Yufraad.
4 Oo Daa'uud wuxuu isagii ka qabsaday kun gaadhifaras, iyo
toddoba kun oo fardooley ah, iyo labaatan kun oo nin oo lug
ah, oo Daa'uudna wuxuu boqno jaray fardihii gaadhiyada
waday oo dhan, laakiinse boqol gaadhifaras buu uga reebay.
5 Oo reer Suuriyihii Dimishaqna markay u yimaadeen inay u
hiiliyaan boqorkii Soobaah oo ahaa Hadarceser, Daa'uud
wuxuu iyagii ka laayay laba iyo labaatan kun oo nin. 6
Daa'uudna wuxuu reer Dimishaq oo Suuriya jooga dhex
dhigay rugo askareed, oo reer Suuriyana Daa'uud bay
addoommo u noqdeen oo baad u keeneen. Oo Rabbiguna
Daa'uud buu siiyey meel kastoo uu tegeyba. 7 Markaasaa
Daa'uud soo qaaday gaashaammadii dahabka ahaa oo
ay wateen addoommadii Hadarceser, wuxuuna keenay
Yeruusaalem. 8 Oo magaalooyinkii Hadarceser oo ahaa
Tibxad iyo Kuun Daa'uud wuxuu ka soo qaaday naxaas
aad u badan, taasoo uu Sulaymaan ka sameeyey berkeddii
naxaasta ahayd iyo tiirarkii iyo weelashii naxaasta ahaa. 9 Oo
Tocuu oo ahaa boqorkii Xamaad markuu maqlay in Daa'uud
laayay Hadarceser oo ahaa boqorkii Soobaah ciidankiisii oo
dhan 10 ayuu Daa'uud wiilkiisii Hadooraam u soo diray inuu
soo salaamo oo uu u soo duceeyo, maxaa yeelay, wuxuu la
diriray oo dilay Hadarceser, waayo, Hadarceser wuxuu la
diriri jiray Tocuu, oo wuxuu keenay weelal cayn kasta ah oo
ah dahab iyo lacag iyo naxaasba. 11 Oo kuwaasna Boqor
Daa'uud wuxuu quduus uga dhigay Rabbiga, oo wuxuu ku
daray lacagtii iyo dahabkii uu ka soo dhacay quruumihii oo
dhan, kuwaasoo ahaa reer Edom, iyo reer Moo'aab, iyo
reer Cammoon, iyo reer Falastiin, iyo reer Camaaleq. 12
Oo weliba Abiishay oo ay Seruuyaah dhashayna wuxuu
reer Edom Dooxadii Cusbada kaga laayay siddeed iyo
toban kun oo nin. 13 Oo isna wuxuu Edom dhex dhigay
rugo askareed, oo reer Edom oo dhammuna Daa'uud bay
addoommo u noqdeen. Oo Rabbiguna Daa'uud guul buu
siiyey meel kastoo uu tegeyba. 14 Oo Daa'uudna reer
binu Israa'iil oo dhan buu u taliyey, oo wuxuu dadkiisa
oo dhan ugu gar qaybshay xukun iyo caddaalad. 15 Oo
waxaa ciidanka u sarrayn jiray Yoo'aab oo ay Seruuyaah
dhashay, oo taariikhdana waxaa qori jiray Yehooshaafaad
ina Axiiluud, 16 oo wadaaddona waxaa ahaa Saadooq ina
Axiituub, iyo Abiimeleg ina Aabyaataar, Shawshaana wuxuu
ahaa karraani. 17 Oo Benaayaah ina Yehooyaadaacna
wuxuu u taliyey reer Kereetiim iyo reer Feleetii, oo Daa'uud
wiilashiisuna waxay ahaayeen madaxda boqorka u dhow.

**19** Taas dabadeedna Naaxaash oo boqor u ahaa reer
Cammoon ayaa dhintay, meeshiisiina waxaa boqor
ka noqday wiilkiisii. 2 Markaasaa Daa'uud yidhi, Anigu
waxaan u roonaan doonaa Xaanuun ina Naaxaash, maxaa
yeelay, aabbihiis baa ii roonaaday. Sidaas daraaddeed
Daa'uud wuxuu u diray wargeeyayaal inay u tacsiyeeyaan
aabbihiis. Markaasaa Daa'uud addoommadiisii waxay dalkii
reer Cammoon ugu yimaadeen Xaanuun inay isaga u
tacsiyeeyaan. 3 Laakiinse amiirradii reer Cammoon waxay
Xaanuun ku yidhaahdeen, Ma waxaad u malaynaysaa in
Daa'uud aabbahaa cisaynayo oo uu sidaas daraaddeed
kuugu soo diray kuwa tacsiyada wada? Addoommadiisu
sow kuuguma iman inay dalka baadhaan oo basaasaan
oo afgembiyaan? 4 Sidaas daraaddeed Xaanuun wuxuu
qabsaday Daa'uud addoommadiisii, oo intuu iyagii u xiiray
ayuu dharkoodiina dhexda ka kala gooyay xataa ilaa dabada,
markaasuu iska eryay. 5 Markaasaa la tegey oo Daa'uud
loo soo sheegay sidii nimankii loo galay. Oo isna wuxuu
iyagii u diray dad ka hor taga, waayo, nimankii aad bay
u ceeboobeen. Boqorkiina wuxuu iyagii ku yidhi, Yerixoo
iska jooga ilaa gadhku idiin soo baxo, dabadeedna soo
noqda. 6 Oo reer Cammoonna markay ogaadeen inay
Daa'uud isnacsiiyeen ayaa Xaanuun iyo reer Cammoon sii
dhiibeen kun talanti oo lacag ah inay gaadhifardood iyo rag

fardooley ah kaga soo kiraystaan Mesobotamiya, iyo Aram
Macakaah, iyo Soobaah. 7 Sidaasay u soo kiraysteen laba
iyo soddon kun oo gaadhifaras, iyo boqorkii Macakaah iyo
dadkiisii, kuwaasoo yimid oo Meedebaa horteeda degay.
Oo reer Cammoonna waxay iska soo wada urursadeen
magaalooyinkoodii, oo dagaal bay u soo baxeen. 8 Oo
Daa'uudna markuu taas maqlay ayuu diray Yoo'aab iyo
ciidankii raggii xoogga lahaa oo dhan. 9 Oo reer Cammoonna
way soo baxeen, oo waxay dagaal isugu soo diyaariyeen
magaalada iriddeeda, oo boqorradii yimidna duurkay keli
ahaantood joogeen. 10 Haddaba Yoo'aab markuu arkay in
dagaal looga soo kacshay hore iyo dibba, ayuu raggii reer
binu Israa'iil ka xushay kuwii xuladka ahaa oo dhan, oo
wuxuu u soo diyaariyey inay reer Suuriya la dagaallamaan. 11
Oo dadkii intiisii kalena wuxuu u dhiibay walaalkiis Abiishay,
oo iyana waxay isu soo diyaariyeen inay reer Cammoon la
dagaallamaan. 12 Oo wuxuu walaalkiis ku yidhi, Haddii reer
Suuriya iga xoog bataan waa inaad i soo caawisaa, laakiinse
haddii reer Cammoon kaa xoog bataan, markaasaan ku
soo caawin doonaa. 13 Haddaba si fiican u dhiirranow,
oo aynu rag u ahaanno dadkeenna iyo magaalooyinka
Ilaaheen aawadood, oo Rabbiguna ha sameeyo wixii la
wanaagsan. 14 Sidaas daraaddeed Yoo'aab iyo dadkii la
jirayba waxay ugu soo dhowaadeen inay la dagaallamaan
reer Suuriya, oo iyana markaasay hortiisa ka carareen. 15 Oo
reer Cammoonna markay arkeen in reer Suuriya carareen
ayay iyana walaalkiis Abiishay hortiisa saasoo kale uga
carareen, oo waxay galeen magaaladii. Markaasaa Yoo'aab
Yeruusaalem yimid. 16 Oo reer Suuriya markay arkeen
in iyaga looga adkaaday reer binu Israa'iil hortooda ayay
wargeeyayaal u direen oo soo kaxeeyeen reer Suuriyihii
Webiga ka shisheeyey, iyagoo uu madax u yahay Shoofag
oo ahaa sirkaalkii ciidanka Hadarceser. 17 Taas waxaa loo
soo sheegay Daa'uud, kolkaasuu reer binu Israa'iil oo dhan
soo wada ururiyey, oo intuu Webi Urdun ka soo gudbay ayuu
reer Suuriya u yimid, oo ciidankiisii ayuu weerar ugu soo
diyaariyey, haddaba Daa'uud markuu raggiisii u diyaariyey
inay reer Suuriya la dagaallamaan ayay iyana la dirireen.
18 Oo reer Suuriyana way ka carareen reer binu Israa'iil
hortooda. Daa'uudna wuxuu reer Suuriya ka laayay toddoba
kun oo gaadhifaras raggoodii, iyo afartan kun oo nin oo lug
ah, oo wuxuu dilay Shoofag oo ahaa sirkaalkii ciidanka. 19
Oo markii Hadarceser addoommadiisii arkeen in reer binu
Israa'iil hortooda looga adkaaday ayay la nabdeen Daa'uud,
wayna u adeegeen, oo reer Suuriyana way diideen inay mar
dambe reer Cammoon caawiyaan.

**20** Oo isla xilligii sannaddii dambe, markay boqorradu
dagaalka u soo bixi jireen ayaa Yoo'aab kaxaystay
xooggii ciidanka oo dhan oo baabbi'iyey dalkii reer
Cammoon, oo haddana intuu soo kacay ayuu Rabbaah
hareereeyey. Yoo'aab wuxuu dagaal ku dhiftay Rabbaah,
wuuna afgembiyey, laakiinse Daa'uud baa Yeruusaalem
iska joogay. 2 Markaasaa Daa'uud boqorkoodii madaxiisii
taajkii ka qaaday, oo wuxuu ogaaday in miisaankiisu yahay
talanti dahab ah, dhagxan qaali ahna wuu lahaa, markaasaa
Daa'uud madaxa loo saaray. Oo wuxuu dibadda u soo
bixiyey dhacii magaalada oo aad iyo aad u badnaa. 3
Dibadduu u soo bixiyey dadkii magaalada ku jiray, oo wuxuu
hoos dhigay miinshaaro iyo biro wax lagu qodo, iyo faasas.
Oo magaalooyinkii reer Cammoon oo dhan Daa'uud saasuu
u wada galay. Markaasaa Daa'uud iyo dadkii oo dhammu
ku noqdeen Yeruusaalem. 4 Oo taas dabadeed waxay
noqotay in reer Falastiin haddana Geser lagula diriray, oo
Sibbekay oo reer Xushaad ahaa wuxuu dilay Sifay, oo ahaa
mid ka mid ah wiilashii Rafaa, oo iyagiina waa la jebiyey. 5
Oo haddana reer Falastiin waa lala diriray, oo Elxaanaan
ina Yaaciir wuxuu dilay Laxmii oo ahaa Goli'ad kii reer
Gad walaalkiis, oo samayda warankiisuna waxay le'ekayd
dharsameeyaha looxiisa. 6 Oo haddana waxaa dagaal ka
dhacay Gad, halkaasna waxaa joogay nin aad u dheer, oo
farihiisa gacmeed iyo farihiisa lugeedna waxay ahaayeen
afar iyo labaatan, oo gacan kasta wuxuu ku lahaa lix, cag
kastana wuxuu ku lahaa lix, oo isna wuxuu u dhashay Rafaa.
7 Oo isna markuu reer binu Israa'iil caayay waxaa isagii dilay
Yoonaataan oo uu Daa'uud walaalkiisii Shimcaa ahaa dhalay.
8 Kuwanu waxay Rafaa ugu dhasheen Gad, oo waxay ku
dhinteen Daa'uud gacantiisii iyo gacantii addoommadiisa.

**21** Haddaba Shayddaan baa ku kacay reer binu Israa'iil oo
wuxuu Daa'uud ku dhaqaajiyey inuu reer binu Israa'iil
tiriyo. 2 Markaasaa Daa'uud ku yidhi Yoo'aab iyo amiirradii,
Taga oo reer binu Israa'iil soo tiriya tan iyo Bi'ir Shebac
iyo ilaa Daan, oo war ii keena si aan u ogaado dadka
tiradiisa. 3 Markaasaa Yoo'aab yidhi, Rabbigu dadkiisa ha
ka dhigo boqol jeer in ka sii badan inta ay haatan yihiin,
laakiinse boqorow sayidkaygiiyow, iyagu kulligood sow ma
aha addoommadaada? Maxaadse waxan u doonaysaa,
sayidkaygiiyow? Oo maxaadse reer binu Israa'iil sabab ay ku
dembaabaan ugu noqonaysaa? 4 Habase yeeshee boqorka
hadalkiisii waa ka adkaaday hadalkii Yoo'aab. Haddaba
sidaas daraaddeed Yoo'aab wuu tegey, oo wuxuu dhex
maray reer binu Israa'iil oo dhan, dabadeedna Yeruusaalem
buu yimid. 5 Markaasaa Yoo'aab Daa'uud siiyey tiradii

dadka, oo reer binu Israa'iil oo dhammu waxay ahaayeen
kun kun iyo boqol kun oo nin oo seefqaad ah, oo reer
Yahuudahna waxay ahaayeen afar boqol iyo toddobaatan
kun oo nin oo seefqaad ah. 6 Laakiinse isagu sooma uu
tirin reer Laawi iyo reer Benyaamiin, maxaa yeelay, Yoo'aab
waa karaahiyeystay boqorka hadalkiisii. 7 Haddaba taas
ayaa Ilaah ugu cadhooday, markaasuu laayay reer binu
Israa'iil. 8 Markaasaa Daa'uud Ilaah ku yidhi, Waxaan
sameeyey aad baan ugu dembaabay, haddaba waan ku
baryayaaye, iga fogee dembigayga anoo addoonkaaga ah,
waayo, nacasnimo weyn baan sameeyey. 9 Markaasaa
Rabbigu la hadlay Gaad oo ahaa Daa'uud waxarkihiisa,
oo wuxuu yidhi, 10 Tag oo Daa'uud la hadal oo waxaad
ku tidhaahdaa, Rabbigu wuxuu kugu leeyahay, Saddexdan
waxyaalood baan ku siinayaa, ee ka dooro mid aan kugu
sameeyo. 11 Sidaas daraaddeed Gaad baa Daa'uud u yimid
oo ku yidhi, Rabbigu wuxuu leeyahay, Midkaad doonaysid
dooro, 12 saddex sannadood oo abaar ah, ama saddex
bilood oo aad ku baabba'did cadaawayaashaada hortooda
iyadoo seefta cadaawayaashaadu ay ku gaadhayso, amase
haddii kale saddex maalmood oo seefta Rabbigu iyadoo
belaayo ah ay dalka dhex marayso, oo ay malaa'igtii Rabbiga
dadka baabbi'inayso kulli dalka reer binu Israa'iil oo dhan.
Haddaba bal ka fiirso jawaabta aan u celiyo kii i soo diray.
13 Markaasaa Daa'uud wuxuu Gaad ku yidhi, Cidhiidhi
weyn baan ku jiraa, Rabbiga gacantiisa aan ku dhaco,
waayo, naxariistiisu waa badan tahay, laakiinse yaanan dad
gacantiis ku dhicin. 14 Saas aawadeed Rabbigu belaayo
ayuu ku soo dejiyey reer binu Israa'iil, oo waxaa reer
binu Israa'iil ka dhintay toddobaatan kun oo nin. 15 Oo
haddana Rabbigu wuxuu Yeruusaalem u soo diray malag
wax baabbi'iya, oo markuu u dhowaaday inuu baabbi'iyo
ayaa Rabbigu fiiriyey, oo belaayadii ka qoomamooday, oo
wuxuu malaggii wax baabbi'inayay ku yidhi, Bes weeye,
haddaba gacanta soo celi. Oo malaggii Rabbigu wuxuu ag
joogay meeshii hadhuudhka lagu tumi jiray oo uu Aarnaankii
reer Yebuus lahaa. 16 Markaasaa Daa'uud indhihii kor
u taagay oo wuxuu arkay malaggii Rabbiga oo taagan
dhulka iyo samada dhexdooda oo gacanta ku haysta seef
gal la' oo Yeruusaalem ku kor fidsan. Markaasay Daa'uud
iyo odayaashiiba, iyagoo dhar joonyad ah qaba, wejiga
dhulka saareen. 17 Markaasaa Daa'uud wuxuu Ilaah ku
yidhi, Kii amray in dadka la soo tiriyo sow aniga ma aha?
Kii dembaabay oo waxa aad u xun sameeyey waa aniga,
laakiinse idahanu maxay sameeyeen? Haddaba Rabbiyow
Ilaahayow, waan ku baryayaaye, gacantaadu ha ka gees
noqoto aniga iyo reerka aabbahay, laakiinse dadkaaga
yaanay ka gees noqon oo aanay belaayo ku dhicin. 18
Markaasaa malaggii Rabbigu Gaad ku amray inuu Daa'uud
ku yidhaahdo, Tag oo Rabbiga meel allabari ugu dhis
meeshii wax lagu tumi jiray ee Aarnaankii reer Yebuus
leeyahay. 19 Oo Daa'uud baa ku tegey wixii uu Gaad yidhi,
oo uu ku hadlay magicii Rabbiga. 20 Markaasaa Aarnaan
soo jeestay oo arkay malaggii, oo afartiisii wiil oo isaga la
joogayna way dhuunteen. Haddaba Aarnaan wuxuu tumayay
sarreen. 21 Oo markii Daa'uud u yimid Aarnaan ayaa
Aarnaan arkay Daa'uud, oo intuu meeshii ka baxay ayuu u
sujuuday Daa'uud, wejigana dhulkuu saaray. 22 Markaasaa
Daa'uud wuxuu Aarnaan ku yidhi, Meeshan wax lagu tumo
i sii, aan meel allabari Rabbiga uga dhisee. Waxaad igu
siinaysaa qiima buuxa in belaayadu ay dadka ka joogsato.
23 Markaasaa Aarnaan wuxuu Daa'uud ku yidhi, Boqorow
sayidkaygiiyow, qaado oo samee wixii kula wanaagsan,
bal eeg, dibida waxaan kuu siinayaa qurbaanno la gubo
aawadiis, oo alaabta wax lagu tumona qoryo aawadood,
sarreenkana qurbaan aawadiis, anigu kulli waan ku wada
siinayaa. 24 Markaasaa Boqor Daa'uud wuxuu Aarnaan
ku yidhi, Maya, laakiinse sida runta ah qiima buuxa ayaan
kaaga iibsanayaa, waayo, Rabbiga u qaadi maayo wax aad
adigu leedahay, oo qurbaan la gubo oo aanan waxba ka
bixin anigu Ilaah ugu bixin maayo. 25 Haddaba Daa'uud
wuxuu Aarnaan meeshii ka siiyey dahab miisaankiisu yahay
lix boqol oo sheqel. 26 Markaasaa Daa'uud halkaas Rabbiga
uga dhisay meel allabari, oo wuxuu u bixiyey qurbaanno la
gubo iyo qurbaanno nabaadiino, oo Rabbiguu baryay, oo
isna wuxuu isagii samada ugaga jawaabay dab ku soo kor
dhacay meeshii qurbaanka la gubo. 27 Markaasaa Rabbigu
amray malaggii, isna seeftiisuu ku celiyey galkeedii. 28 Oo
isla markaasba Daa'uud markuu arkay in Rabbigu isaga uga
jawaabay meeshii wax lagu tumi jiray oo uu lahaa Aarnaan
oo ahaa reer Yebuus ayuu halkaas ku allabaryay. 29 Waayo,
taambuuggii Rabbiga ee Muuse cidlada ku dhex sameeyey
iyo meeshii qurbaanka la guboba markaas waxay dhex
yiilleen meesha sare ee Gibecoon ku taal. 30 Laakiinse
Daa'uud meeshaas ma uu hor tegi karin inuu Ilaah wax
soo weyddiisto, maxaa yeelay, wuxuu ka baqayay seeftii
malagga Rabbiga.

22 Markaasaa Daa'uud yidhi, Kanu waa gurigii Rabbiga
Ilaaha ah, oo tanuna waa meeshii qurbaanka la gubo
oo reer binu Israa'iil. 2 Markaasaa Daa'uud amray in la
soo wada ururiyo shisheeyayaashii dalka reer binu Israa'iil
degganaa oo dhan, oo wuxuu kaloo amray in wastaadyo
dhagxan soo qoraan in la dhiso gurigii Ilaah aawadeed. 3

Oo Daa'uud wuxuu diyaariyey bir faro badan in musmaarro
looga dhigo albaabbada irdaha iyo qabsatooyinka, oo wuxuu
kaloo diyaariyey naxaas tiro badan oo aan miisaan lahayn,
4 iyo geedo kedar ah oo aan tiro lahayn, waayo, reer Siidoon
iyo reer Turos waxay Daa'uud u keeneen geedo kedar
ah oo tiro badan. 5 Markaasaa Daa'uud yidhi, Wiilkayga
Sulaymaan waa yar yahay, waana tabar daranyahay, oo
guriga Rabbiga loo dhisayaana waa inuu ahaado mid aad iyo
aad u weyn, oo magac iyo ammaan ku leh kulli waddammada
oo dhan, haddaba wax baan u sii diyaarin doonaa. Sidaas
daraaddeed Daa'uud waxyaalo faro badan ayuu diyaariyey
intuusan dhiman ka hor. 6 Markaasuu wiilkiisii Sulaymaan
u yeedhay oo wuxuu ku amray inuu guri u dhiso Rabbiga
ah Ilaaha reer binu Israa'iil. 7 Oo haddana Daa'uud wuxuu
wiilkiisii Sulaymaan ku yidhi, Waxaa qalbigayga ku jiray inaan
guri u dhiso magaca Rabbiga Ilaahayga ah. 8 Laakiinse
waxaa ii yimid Eraygii Rabbiga oo leh, Adigu waxaad
daadisay dhiig badan, oo aad baad u dagaallantay. Waa
inaadan guri u dhisin magacayga, maxaa yeelay, dhiig badan
ayaad dhulka ku daadisay anigoo u jeeda. 9 Oo bal eeg,
waxaa kuu dhalan doona wiil, kaasoo ahaan doona nin
nasasho, oo waxaan ka nasin doonaa cadaawayaashiisa ku
wareegsan oo dhan, oo isaga magiciisu wuxuu ahaan doonaa
Sulaymaan, oo wakhtigiisa waxaan reer binu Israa'iil siin
doonaa nabad iyo xasilloonaan. 10 Oo guri buu magacayga
u dhisi doonaa, oo wuxuu ahaan doonaa wiilkaygii, oo anna
waxaan u ahaan doonaa aabbihiis, oo waxaan carshiga
boqortooyadiisa u xoogayn doonaa inuu weligiis u taliyo
reer binu Israa'iil. 11 Haddaba wiilkaygiiyow, Rabbigu ha
kula jiro, oo u barwaaqow, oo gurigii Rabbiga Ilaahaaga
ah u dhis siduu kaaga hadlay. 12 Oo Rabbigu ha ku siiyo
xigmad iyo waxgarasho, oo amarka reer binu Israa'iilna ha
kuu dhiibo si aad u dhawrtid sharciga Rabbiga Ilaahaaga ah.
13 Markaas waad barwaaqoobi doontaa haddaad dhawrto
oo yeesho qaynuunnadii iyo xukummadii Rabbigu Muuse
ku amray oo uu reer binu Israa'iil ugu soo dhiibay; xoog
yeelo, oo aad u dhiirranow, ha cabsan, hana qalbi jabin.
14 Haddaba bal eeg, anoo dhibaataysan waxaan guriga
Rabbiga u diyaarshay boqol kun oo talanti oo dahab ah,
iyo kun kun oo talanti oo lacag ah, iyo naxaas iyo bir aan
miisaan lahayn, waayo, aad bay u badan yihiin, oo weliba
waxaan kaloo diyaariyey alwaax iyo dhagxan, oo adiguna
intaas wax baad ku sii dari karaysaa. 15 Oo weliba waxaa
kula jira rag shaqaale ah oo faro badan, kuwaasoo ah kuwa
qora oo ka shaqeeya dhagxanta iyo alwaaxdaba, iyo rag
kasta oo yaqaan sanco kasta, 16 oo ah tan dahabka, iyo
tan lacagta, iyo tan naxaasta, iyo tan birta, iyagu tiro ma
leh, haddaba kac oo shaqee, oo Rabbiguna ha kula jiro.
17 Oo haddana Daa'uud wuxuu amiirradii reer binu Israa'iil
oo dhan ku amray inay caawiyaan wiilkiisa Sulaymaan.
18 Oo wuxuu iyagii ku yidhi, War sow Rabbiga Ilaahiinna
ahu idinlama jiro? Oo sow dhan kastaba nasasho idinkama
siin? Waayo, dadyowgii dalka degganaa oo dhan ayuu soo
geliyey gacantayda, oo dalkiina waxaa lagu jebshay Rabbiga
iyo dadkiisa hortooda. 19 Haddaba qalbigiinna iyo naftiinna
u jeediya inaad Rabbiga Ilaahiinna ah doondoontaan, oo
sidaas daraaddeed kaca oo dhisa meesha quduuska ah
oo Rabbiga Ilaahiinna ah, in sanduuqii axdiga Rabbiga iyo
weelashii Ilaah oo quduuska ahaa la soo geliyo guriga loo
dhisayo magaca Rabbiga.

**23** Haddaba Daa'uud wuu gaboobay, wuuna da' weynaa,
markaasuu reer binu Israa'iil boqor uga dhigay wiilkiisii
Sulaymaan. 2 Oo wuxuu soo wada ururiyey amiirradii reer
binu Israa'iil oo dhan, iyo wadaaddadii iyo kuwii reer Laawiba.
3 Markaasaa la tiriyey reer Laawi intoodii soddon sannadood
jirtay ama ka sii weynayd, oo markii nin nin loo tiriyey,
dhammaantood tiradoodii waxay noqotay siddeed iyo soddon
kun oo nin. 4 Oo kuwaas afar iyo labaatan kun oo ka mid
ahu waxay ahaayeen kuwo ilaaliya hawsha guriga Rabbiga,
oo lix kunna waxay ahaayeen saraakiil iyo xaakinno, 5 oo
afar kunna waxay ahaayeen iridjoogayaal, oo afar kunna
waxay Rabbiga ku ammaani jireen alaabtii aan u sameeyey
in isaga lagu ammaano ayuu Daa'uud yidhi. 6 Oo Daa'uud
wuxuu iyagii u kala qaybiyey koox koox sidii ay ahaayeen
wiilashii Laawi, kuwaas oo ahaa: Gershoon, iyo Qohaad, iyo
Meraarii. 7 Reer Gershoon waxaa ahaa Lacdaan iyo Shimcii.
8 Wiilashii Lacdaan waxay ahaayeen saddex, waana Yexii'eel
oo madax ahaa, iyo Seetaam, iyo Yoo'eel. 9 Wiilashii
Shimciina waxay ahaayeen saddex, waana Shelomood, iyo
Xasii'eel, iyo Xaaraan, kuwaasu waxay ahaayeen madaxdii
qolooyinkii reer Lacdaan. 10 Oo waxaa wiilashii Shimcii ahaa
Yaaxad, iyo Siinaa, iyo Yecuush, iyo Beriicaah. Afartaasuba
waxay ahaayeen wiilashii Shimcii. 11 Oo waxaa madax
ahaa Yaaxad, Siisaahna wuxuu ahaa kii labaad, laakiinse
Yecuush iyo Beriicaah wiilal badan ma ay lahayn, oo sidaas
daraaddeed iyaga waxaa loo tiriyey isku reer. 12 Wiilashii
Qohaadna waxay ahaayeen afar, waana Camraam, iyo
Isehaar, iyo Xebroon iyo Cusii'eel. 13 Wiilashii Camraamna
waxay ahaayeen Haaruun iyo Muuse, oo Haaruun waxaa
gooni looga dhigay inay isagii iyo wiilashiisuba weligood
quduus ka dhigaan waxyaalaha ugu wada quduusan iyo
inay Rabbiga hortiisa foox ku shidaan, oo ay u adeegaan
oo ay weligoodba magiciisa ku duceeyaan. 14 Laakiinse

Muuse oo ahaa nin Ilaah wiilashiisii waxaa lagu tiriyey
qabiilka reer Laawi. 15 Wiilashii Muusena waxay ahaayeen
Gershoom iyo Eliiceser. 16 Ina Gershoomna wuxuu ahaa
Shebuu'eel oo madax ahaa. 17 Ina Eliiceserna wuxuu ahaa
Rexabyaah oo madax ahaa. Oo Eliiceser innaba wiilal
kale ma lahayn, laakiinse Rexabyaah wiilashiisu aad bay
u badnaayeen. 18 Ina Isehaarna wuxuu ahaa Shelomiid
oo madax ahaa. 19 Wiilashii Xebroonna waxay ahaayeen
Yeriyaah oo madax ahaa, iyo Amaryaah oo ahaa kii labaad,
iyo Yaxasii'eel oo ahaa kii saddexaad, iyo Yeqamcaam oo
ahaa kii afraad. 20 Wiilashii Cusii'eelna waxay ahaayeen
Miikaah oo madax ahaa, iyo Yishiyaah oo ahaa kii labaad.
21 Wiilashii Meraariina waxay ahaayeen Maxlii iyo Mushii.
Wiilashii Maxliina waxay ahaayeen Elecaasaar iyo Qiish.
22 Oo Elecaasaarna wuxuu dhintay isagoo gabdho keliya
mooyaane aan wiilal lahayn, oo waxaa gabdhihiisii guursaday
reer Qiish oo ahaa ilma-adeerradood. 23 Wiilashii Mushiina
waxay ahaayeen saddex, waana Maxlii iyo Ceeder iyo
Yereemood. 24 Kuwaasu waxay ahaayeen reer Laawi sidii
qolooyinkoodu kala ahaayeen, waana kuwii ahaa madaxdii
reeraha kuwii la tiriyey, oo magacyadooda nin nin loo tiriyey,
kuwaasoo samayn jiray shuqulkii hawsha guriga Rabbiga,
waana intii labaatan sannadood jirtay ama ka sii weynayd.
25 Waayo, Daa'uud wuxuu yidhi, Rabbiga ah Ilaaha reer binu
Israa'iil dadkiisuu nasiyey, oo weligiis wuxuu deggan yahay
Yeruusaalem. 26 Weliba reer Laawina mar dambe uma
baahan doonaan inay qaadaan taambuugga iyo weelashiisa
lagaga adeego oo dhan. 27 Oo Daa'uud dardaarankiisii
ayaa reer Laawi lagu tiriyey, intoodii labaatan sannadood
jirtay ama ka sii weynayd. 28 Waayo, shuqulkoodu wuxuu
ahaa inay reer Haaruun amarkooda ku adeegaan oo ay
qabtaan hawshii guriga Rabbiga, iyo inay ka adeegaan
barxadaha iyo qowladaha, iyo inay daahiriyaan waxyaalaha
quduuska ah oo dhan, kaasu wuxuu ahaa shuqulka hawsha
guriga Rabbiga. 29 Oo weliba waxay kala hagaajin jireen
kibistii tusniinta iyo burkii laga dhigi jiray qurbaan jidhiidh
ah, hadduu ahaa kibis aan khamiir lahayn ama tii digsiga
lagu dubi jiray, amase tii la qoyn jiray, iyo cayn kasta oo ah
qiyaas iyo miisaan, 30 iyo inay subax kasta u istaagaan inay
Rabbiga ku mahadnaqaan oo ammaanaan, oo haddana
habeenkiina saasoo kalay yeeli jireen. 31 Oo haddana waxay
had iyo goor Rabbiga hortiisa ku bixin jireen qurbaanno la
gubo oo dhan, waxayna bixin jireen sabtiyada, iyo markay
bilaha cusubu dhashaan, iyo iidaha, waxayna u bixin jireen
si waafaqsan tiradoodii qaynuunka ku qornayd, 32 wayna
ilaalin jireen teendhada shirka, iyo meesha quduuska ah,
iyo reer Haaruun oo iyaga walaalahood ah, oo saasay uga
adeegi jireen guriga Rabbiga.

**24** Oo kooxihii reer Haaruunna waa kuwan. Wiilashii
Haaruun waxay ahaayeen Naadaab, iyo Abiihuu, iyo
Elecaasaar, iyo Iitaamaar. 2 Laakiinse Naadaab iyo Abiihuuba
aabbahood way ka hor dhinteen, oo carruurna ma ay lahayn,
haddaba sidaas daraaddeed hawshii wadaadnimada waxaa
samayn jiray Elecaasaar iyo Iitaamaar. 3 Oo Daa'uud oo ay
la jiraan Saadooq oo ahaa reer Elecaasaar iyo Axiimeleg
oo ahaa reer Iitaamaar ayaa iyagii u kala qaybiyey sidii
hawshoodu kala ahayd. 4 Oo reer Elecaasaar waxaa
laga dhex helay niman madax ah oo ka badan intii reer
Iitaamaar laga helay, oo iyagii sidanaa loo kala qaybiyey,
reer Elecaasaar waxaa ku jiray lix iyo toban nin, oo qolooyin
madax u ah, oo reer Iitaamaarna waxaa ku jiray siddeed, sidii
qolooyinkoodu kala ahaayeen. 5 Oo sidanaa iyagii saami
loogu kala qaybiyey, oo caynba caynkii kale waa lagu daray,
waayo, waxaa jiray amiirro meesha quduuska ah, iyo amiirro
Ilaah oo ahaa reer Elecaasaar iyo reer Iitaamaar labadaba.
6 Oo Shemacyaah ina Netaneel oo karraanigii ahaa, oo ahaa
reer Laawi ayaa iyagii ku hor qoray boqorkii, iyo amiirradii,
iyo wadaadkii Saadooq, iyo Axiimeleg ina Aabyaataar, iyo
madaxdii qolooyinkii wadaaddada iyo reer Laawi ahaa, in reer
loo qaado reer Elecaasaar, reerna loo qaado reer Iitaamaar. 7
Haddaba saamigii kowaad wuxuu u soo baxay Yehooyaariib,
kii labaadna Yedacyaah, 8 kii saddexaadna Haarim, kii
afraadna Secoriim, 9 kii shanaadna Malkiiyaah, kii lixaadna
Miyaamin, 10 kii toddobaadna Haqoos, kii siddeedaadna
Abiiyaah, 11 kii sagaalaadna Yeeshuuca, kii tobnaadna
Shekaanyaah, 12 kii kow iyo tobnaadna Eliyaashiib, kii laba
iyo tobnaadna Yaaqiim, 13 kii saddex iyo tobnaadna Xufaah,
kii afar iyo tobnaadna Yeshebe'aab, 14 kii shan iyo tobnaadna
Bilgaah, kii lix iyo tobnaadna Immeer, 15 kii toddoba iyo
tobnaadna Xeesiir, kii siddeed iyo tobnaadna Hafisees,
16 kii sagaal iyo tobnaadna Fetaxyaah, kii labaatanaadna
Yexesqeel, 17 kii kow iyo labaatanaadna Yaakiin, kii laba iyo
labaatanaadna Gaamuul, 18 kii saddex iyo labaatanaadna
Dalaayaah, kii afar iyo labaatanaadna Macasyaah. 19
Kaasu wuxuu ahaa qaynuunkii ay u kala qaybsanaayeen
oo ay hawshooda ku qaban jireen, inay gurigii Rabbiga ku
soo galaan qaynuunkii iyaga lagu soo dhiibay awowgood
Haaruun, sidii Rabbiga ah Ilaaha reer binu Israa'iil uu isaga
ku amray. 20 Oo reer Laawi intii hadhayna waxaa ka mid ahaa
kuwan, wiilashii Camraam waxaa ka joogay Shuubaa'eel,
wiilashii Shuubaa'eelna waxaa ka joogay Yexdeyaah. 21
Reer Rexabyaahna waxaa wiilashii Rexabyaah ka joogay

Yishyaah oo madax ahaa. 22 Reer Isehaarna waxaa ka
joogay Shelomoo, wiilashii Shelomoodna waxaa ka joogay
Yaaxad. 23 Wiilashii Xebroonna waxaa ka joogay Yeriyaah
oo madax ahaa, iyo Amaryaah oo ahaa kii labaad, iyo
Yaxasii'eel oo ahaa kii saddexaad, iyo Yeqamcaam oo ahaa
kii afraad. 24 Wiilashii Cusii'eelna waxaa ka joogay Miikaah,
wiilashii Miikaahna waxaa ka joogay Shaamiir. 25 Oo Miikaah
walaalkiisna wuxuu ahaa Yishyaah, wiilashii Yishyaahna
waxaa ka joogay Sekaryaah. 26 Wiilashii Meraariina waxaa
ka joogay Maxlii iyo Mushii, wiilashii Yacasiyaahna waxaa
ka joogay Benoo. 27 Wiilashii Meraariina, waxaa reer
Yacasiyaah ka joogay Benoo, iyo Shoham, iyo Sakuur, iyo
Cibrii. 28 Reer Maxliina waxaa ka joogay Elecaasaar, oo
aan waxba wiilal lahayn. 29 Reer Qiishna waxaa ka joogay
ina Qiish, oo ahaa Yeraxme'eel. 30 Reer Mushii waxaa ka
joogay Maxlii, iyo Ceeder, iyo Yeriimood. Kuwaasu waxay
ahaayeen reer Laawi siday qolooyinkoodu kala ahaayeen. 31
Oo kuwanu iyana waxay riteen saami sidii walaalahood reer
Haaruun ay yeeleen oo kale, oo waxay ku hor riteen Boqor
Daa'uud, iyo Saadooq, iyo Axiimeleg, iyo kuwii madaxda u
ahaa qolooyinkii wadaaddada iyo reer Laawi. Kan qolooyinkii
madaxda u ahaa waxaa lagala mid dhigay sida kuwa
walaalkiisa yar.

**25** Oo weliba Daa'uud iyo saraakiishii ciidanku waxay
adeegiddii u sooceen kuwa ah reer Aasaaf, iyo reer
Heemaan, iyo reer Yeduutuun, kuwaasoo wax ku sii sheega
kataarado iyo shareerado iyo suxuun laysku garaaco,
oo kuwa shuqulka qabta sidii adeegiddoodu kala ahayd
tiradoodii waxay ahayd: 2 reer Aasaaf oo ahaa Sakuur,
iyo Yuusuf, iyo Netanyaah, iyo Asareelaah, intaasu waxay
ahaayeen reer Aasaaf oo ka hooseeya Aasaaf kaasoo markii
boqorku amro wax sii sheegi jiray, 3 iyo reer Yeduutuun,
oo wiilashii Yeduutuunna waxay ahaayeen lix, oo ahaa
Gedalyaah, iyo Serii, iyo Yeshacyaah, iyo Xashabyaah,
iyo Matityaah, oo waxay ka wada hooseeyeen aabbahood
Yeduutuun oo kataaradda lahaa oo wax sii sheegi jiray
markuu Rabbiga u mahadnaqayo oo ammaanayo, 4 iyo
reer Heemaan: oo wiilashii Heemaanna waxay ahaayeen
Buqiyaah, iyo Matanyaah, iyo Cusii'eel, iyo Shebuu'eel, iyo
Yeriimood, iyo Xananyaah, iyo Xanaanii, iyo Elii'aataah,
iyo Giddaltii, iyo Romamtii Ceser, iyo Yaashbeqaashaah,
iyo Mallootii, iyo Hootiir, iyo Maxasii'ood. 5 Oo kuwaas oo
dhammuna waxay ahaayeen wiilashii Heemaan kaasoo
ahaa waxarkihii boqorka u sheegi jiray erayadii Ilaah, oo
geeska kor u qaadi jiray. Oo Ilaahna wuxuu Heemaan siiyey
afar iyo toban wiil iyo saddex gabdhood. 6 Oo intaas oo
dhammu waxay ka hooseeyeen aabbahood inay gurigii
Rabbiga ku dhex gabyaan iyagoo haysta suxuun laysku
garaaco, iyo shareerado, iyo kataarado, inay ka adeegaan
guriga Ilaah, oo boqorku wuxuu saas ku amray Aasaaf iyo
Yeduutuun iyo Heemaan. 7 Oo iyagii iyo walaalahood la jiray
ee la baray inay Rabbiga u gabyaan kuwaasoo dhammaan
farsamada yiqiin tiradoodu waxay ahayd laba boqol iyo
siddeed iyo siddeetan nin. 8 Oo iyana hawshoodii waxay u
riteen saami iswada le'eg, oo way isle'ekaysteen, kan ugu
yar iyo kan ugu weyn, iyo xataa macallin iyo ardayba, waxba
isma dheeraysan. 9 Haddaba saamigii kowaad wuxuu u soo
baxay reer Aasaaf oo waxaa helay Yuusuf. Kii labaadna
wuxuu u soo baxay Gedalyaah, oo isaga iyo walaalihiis iyo
wiilashiisiiba waxay isku ahaayeen laba iyo toban. 10 Kii
saddexaadna wuxuu u soo baxay Sakuur, iyo wiilashiisii iyo
walaalihiisba oo ahaa laba iyo toban nin. 11 Kii afraadna
wuxuu u soo baxay Yisrii, iyo wiilashiisii iyo walaalihiisba oo
ahaa laba iyo toban. 12 Kii shanaadna wuxuu u soo baxay
Netanyaah, iyo wiilashiisii iyo walaalihiisba oo ahaa laba
iyo toban. 13 Kii lixaadna wuxuu u soo baxay Buqiyaah,
iyo wiilashiisii iyo walaalihiisba oo ahaa laba iyo toban. 14
Kii toddobaadna wuxuu u soo baxay Yeshareelaah, iyo
wiilashiisii iyo walaalihiisba oo ahaa laba iyo toban. 15
Kii siddeedaadna wuxuu u soo baxay Yeshacyaah, iyo
wiilashiisii iyo walaalihiisba oo ahaa laba iyo toban. 16 Kii
sagaalaadna wuxuu u soo baxay Matanyaah, iyo wiilashiisii
iyo walaalihiisba oo ahaa laba iyo toban. 17 Kii tobnaadna
wuxuu u soo baxay Shimcii, iyo wiilashiisii iyo walaalihiisba
oo ahaa laba iyo toban. 18 Kii kow iyo tobnaadna wuxuu
u soo baxay Casareel, iyo wiilashiisii iyo walaalihiisba oo
ahaa laba iyo toban. 19 Kii laba iyo tobnaadna wuxuu u
soo baxay Xashabyaah, iyo wiilashiisii iyo walaalihiisba oo
ahaa laba iyo toban. 20 Kii saddex iyo tobnaadna wuxuu
u soo baxay Shuubaa'eel, iyo wiilashiisii iyo walaalihiisba
oo ahaa laba iyo toban. 21 Kii afar iyo tobnaadna wuxuu
u soo baxay Matityaah, iyo wiilashiisii iyo walaalihiisba oo
ahaa laba iyo toban. 22 Kii shan iyo tobnaadna wuxuu u soo
baxay Yereemood, iyo wiilashiisii iyo walaalihiisba oo ahaa
laba iyo toban. 23 Kii lix iyo tobnaadna wuxuu u soo baxay
Xananyaah, iyo wiilashiisii iyo walaalihiisba oo ahaa laba iyo
toban. 24 Kii toddoba iyo tobnaadna wuxuu u soo baxay
Yaashbeqaashaah, iyo wiilashiisii iyo walaalihiisba oo ahaa
laba iyo toban. 25 Kii siddeed iyo tobnaadna wuxuu u soo
baxay Xanaanii, iyo wiilashiisii iyo walaalihiisba oo ahaa laba
iyo toban. 26 Kii sagaal iyo tobnaadna wuxuu u soo baxay
Mallootii, iyo wiilashiisii iyo walaalihiisba oo ahaa laba iyo
toban. 27 Kii labaatanaadna wuxuu u soo baxay Elii'aataah,
iyo wiilashiisii iyo walaalihiisba oo ahaa laba iyo toban. 28

Kii kow iyo labaatanaadna wuxuu u soo baxay Hootiir, iyo
wiilashiisii iyo walaalihiisba oo ahaa laba iyo toban. 29 Kii
laba iyo labaatanaadna wuxuu u soo baxay Giddaltii, iyo
wiilashiisii iyo walaalihiisba oo ahaa laba iyo toban. 30 Kii
saddex iyo labaatanaadna wuxuu u soo baxay Maxasii'ood,
iyo wiilashiisii iyo walaalihiisba oo ahaa laba iyo toban. 31 Kii
afar iyo labaatanaadna wuxuu u soo baxay Romamtii Ceser,
iyo wiilashiisii iyo walaalihiisba oo ahaa laba iyo toban.

**26** Oo kooxihii iridjoogayaashiina waa kuwan: reer Qorax
waxaa laga doortay Meshelemyaah ina Qore oo ahaa
reer Aasaaf. 2 Oo Meshelemyaahna wuxuu lahaa wiilal, oo
curadkiisii wuxuu ahaa Sekaryaah, kii labaadna Yediica'eel,
kii saddexaadna Sebadyaah, kii afraadna Yatnii'eel, 3
kii shanaadna Ceelaam, kii lixaadna Yehooxaanaan, kii
toddobaadna Eliihooceenay. 4 Oo Cobeed Edoomna wuxuu
lahaa wiilal, oo curadkiisii wuxuu ahaa Shemacyaah, kii
labaadna Yehoosaabaad, kii saddexaadna Yoo'aax, kii
afraadna Saakaar, kii shanaadna Netaneel, 5 kii lixaadna
Ammii'eel, kii toddobaadna Isaakaar, kii siddeedaadna
Fecultay, waayo, Ilaah baa isaga barakeeyey. 6 Oo weliba
wiilkiisii Shemacyaahna wiilal baa u dhashay, oo iyagaa u talin
jiray reerkii aabbahood, waayo, waxay ahaayeen rag xoog
badan. 7 Wiilashii Shemacyaahna waxay ahaayeen Cotnii,
iyo Refa'eel, iyo Coobeed, iyo Elsaabaad, walaalahoodna oo
ah Eliihuu iyo Semakiyaah waxay ahaayeen rag xoog badan.
8 Oo kulli intaasoo dhammu waxay ahaayeen reer Cobeed
Edoom, oo iyaga iyo wiilashoodii iyo walaalahoodba waxay
ahaayeen rag xoog iyo karti adeegidda u leh, waxayna
ahaayeen laba iyo lixdan nin oo reer Cobeed Edoom
wada ah. 9 Oo Meshelemyaahna wuxuu lahaa siddeed
iyo toban nin oo ahaa rag xoog badan, waxayna wada
ahaayeen wiilashiisii iyo walaalihiis. 10 Oo weliba Xosaah
oo ahaa reer Meraariina wuxuu lahaa wiilal, waxaana ugu
weynaa Shimrii (waayo, in kastoo uusan curadkii ahayn
haddana aabbihiis ayaa madax ka dhigay), 11 kii labaadna
wuxuu ahaa Xilqiyaah, kii saddexaadna Tebalyaah, kii
afraadna Sekaryaah. Oo Xosaah wiilashiisii iyo walaalihiis
oo dhammu waxay ahaayeen saddex iyo toban. 12 Oo
iridjoogayaasha kooxahooduna intaasay ka koobnaayeen,
waxayna ahaayeen rag madax ah, oo sida walaalahood
hawl madax ka ah inay guriga Rabbiga ka dhex adeegaan.
13 Oo iyana midkooda ugu yar iyo midka ugu weynba, sidii
ay qolooyinkoodu kala ahaayeen ayay irid kasta saami ugu
riteen. 14 Oo saamigii dhanka bari wuxuu u soo baxay
Shelemyaah. Oo haddana waxay saami u rideen wiilkiisii
Sekaryaah, oo ahaa lataliye xigmad badan, oo saamigiisiina
wuxuu ku helay dhankii woqooyi. 15 Cobeed Edoomna
waxaa u soo baxay dhankii koonfureed, oo wiilashiisiina
waxaa u soo baxay guryihii wax lagu kaydin jiray. 16 Shufiim
iyo Xosaahna waxaa u soo baxay dhankii galbeed oo u
dhowaa iriddii Shalleked la odhan jiray, oo ku ag tiil jidka kor
u baxa, oo waardiyeba waardiyaha kaluu ka soo hor jeeday.
17 Dhanka bari waxaa joogi jiray lix reer Laawi ah, dhanka
woqooyina maalintiiba waxaa dhawri jiray afar nin, dhanka
koonfureedna maalintiiba waxaa dhawri jiray afar nin, oo
guryaha wax lagu kaydiyana waxaa dhawri jiray laba laba
nin. 18 Oo Farbaar dhankeedii galbeed, oo u dhow jidkiina
waxaa dhawri jiray afar, oo Farbaarna waxaa dhawri jiray
laba. 19 Intaasu waxay ahaayeen kooxihii iridjoogayaasha,
oo waxayna ahaayeen reer Qorax iyo reer Meraarii. 20
Oo mid ka mid ahaa reer Laawi oo Axiiyaah ahaana
wuxuu u talin jiray khasnadihii guriga Ilaah, iyo khasnadihii
ay alaabta quduuska ahu tiil. 21 Kuwii reer Lacdaan ee
reer Gershoon oo uu lahaa Lacdaan, oo ahaa madaxdii
reerahooda oo uu lahaa Lacdaan oo ahaa reer Gershoon,
waxay ahaayeen Yexii'eelii, 22 iyo wiilashii Yexii'eelii oo ahaa
Seetaam, iyo Yoo'eel oo walaalkiis ahaa, waxayna u talin
jireen khasnadihii guriga Rabbiga. 23 Oo waxaana jiray
reer Camraam, iyo reer Isehaar, iyo reer Xebroon, iyo reer
Cusii'eel. 24 Oo Shebuu'eel oo ahaa ina Gershoom, oo ahaa
reer Muusena wuxuu ahaa taliye xukuma khasnadihii. 25
Waxaana la jiray walaalihiis ahaa reer Eliiceser, kuwaasoo
ahaa wiilkiisii Rexabyaah, iyo isagii wiilkiisii Yeshacyaah, iyo
isagii wiilkiisii Yooraam, iyo isagii wiilkiisii Sikrii, iyo isagii
wiilkiisii Shelomood. 26 Oo kuwan oo ah Shelomood iyo
walaalihiis waxay u talin jireen khasnadihii alaabta quduuska
ah, kuwaasoo ay quduus ka dhigeen Boqor Daa'uud, iyo
madaxdii qolooyinka, iyo kuwii kun kun u taliyey iyo kuwii
boqol boqol u taliyey, iyo saraakiishii ciidanku. 27 Maalkii
boolida ahaa oo dagaalka lagu soo dhacay waxay quduus
uga dhigeen si loogu cusboonaysiiyo gurigii Rabbiga. 28 Oo
kulli waxyaalihii ay quduus ka dhigeen Samuu'eel oo wax
arke ahaa, iyo Saa'uul ina Qiish, iyo Abneer ina Neer, iyo
Yoo'aab oo ay Seruuyaah dhashay, iyo wax alla wixii quduus
laga dhigay oo dhammu waxay ku jireen gacantii Shelomood
iyo tii walaalihiis. 29 Oo Kenanyaah iyo wiilashiisii oo ahaa
reer Isehaarna waxay saraakiil iyo xaakinno u ahaayeen
hawlaha dibadda oo reer binu Israa'iil. 30 Oo Xashabyaah
iyo walaalihiis oo ahaa reer Xebroon, oo weliba ahaa rag
xoog badan, oo tiradoodu ahayd kun iyo toddoba boqol oo
nin, waxay u talin jireen reer binu Israa'iilkii dhanka galbeed
oo Webi Urdun ka shisheeyey, iyo shuqulkii Rabbiga oo
dhan, iyo adeegiddii boqorkaba. 31 Oo reer Xebroonna

Yeriyaah madax buu ahaa, intaasu waa reer Xebroon sidii
dadka reerahoodu u kala dhasheen. Oo waxaa iyaga la
doondoonay sannaddii afartanaad oo boqortooyadii Daa'uud,
oo waxaa iyaga dhexdoodii laga helay rag xoog badan oo
jooga Yacser tii reer Gilecaad. **32** Oo walaalihiis oo ahaa
rag xoog badanuna waxay ahaayeen laba kun iyo toddoba
boqol oo nin, oo ah madaxdii qolooyinka kuwaasoo boqor
Daa'uud uu ka dhigay inay taliyayaal ugu ahaadaan reer
Ruubeen, iyo reer Gaad, iyo qabiilkii reer Manaseh badhkiis,
xagga wax kasta oo xag Ilaah ku saabsan, iyo xagga danaha
boqorkaba.

**27** Haddaba waa tan reer binu Israa'iil sidii tiradoodu ay
ahayd, waxayna ahaayeen madaxdii qolooyinka, iyo
kuwii kun kun u taliyey, iyo kuwii boqol boqol u taliyey,
iyo saraakiishoodii boqorka uga adeegi jiray wax kasta oo
ku saabsan kooxihii soo geli jiray oo bixi jiray bil kasta
oo ah bilaha sannadda oo dhan; koox kasta tiradeedu
waxay ahayd afar iyo labaatan kun oo nin. **2** Oo kooxdii
kowaad ee bixi jirtay bishii kowaad waxaa madax u ahaa
Yaashaabcaam ina Sabdii'eel, oo kooxdiisana waxaa ku jiray
afar iyo labaatan kun oo nin. **3** Oo isagu wuxuu ahaa reer
Feres, wuxuuna ugu wada sarreeyey saraakiishii ciidanka
oo bishii kowaad bixi jiray oo dhan. **4** Oo kooxdii bishii
labaadna waxaa madax u ahaa Doday oo ahaa reer Axoo'ax,
oo kooxdiisa waxaa ku jiray Miqlood oo taliye ahaa, oo
kooxdiisana waxaa ku jiray afar iyo labaatan kun oo nin. **5**
Oo sirkaalkii saddexaad ee ciidanka oo bishii saddexaad bixi
jirayna wuxuu ahaa Benaayaah oo madax ahaa oo ahaa
ina wadaadkii ahaa Yehooyaadaac, oo isaga kooxdiisana
waxaa ku jiray afar iyo labaatan kun oo nin. **6** Oo kaasu
waa Benaayaah oo ahaa kii ugu xoog badnaa soddonkii,
oo weliba soddonka madax u ahaa, oo kooxdiisana waxaa
ku jiray wiilkiisii Cammiisaabaad. **7** Oo sirkaalkii afraad ee
bishii afraad bixi jirayna wuxuu ahaa Casaaheel oo ahaa
Yoo'aab walaalkiis, wiilkiisii Sebadyaahna wuu ku xigay,
oo isaga kooxdiisana waxaa ku jiray afar iyo labaatan kun
oo nin. **8** Oo sirkaalkii shanaad ee bishii shanaad bixi
jirayna wuxuu ahaa Shamhuud oo ahaa reer Yisraax, oo
kooxdiisana waxaa ku jiray afar iyo labaatan kun oo nin. **9** Oo
sirkaalkii lixaad oo bishii lixaad bixi jirayna wuxuu ahaa Ciiraa
ina Ciqeesh oo ahaa reer Teqooca, oo isaga kooxdiisana
waxaa ku jiray afar iyo labaatan kun oo nin. **10** Oo sirkaalkii
toddobaad ee bishii toddobaad bixi jirayna wuxuu ahaa
Xeles oo ahaa reer Feloonii, oo ka ahaa reer Efrayim, oo
isaga kooxdiisana waxaa ku jiray afar iyo labaatan kun oo
nin. **11** Oo sirkaalkii siddeedaad oo bishii siddeedaad bixi
jirayna wuxuu ahaa Sibbekay oo ahaa reer Xushaad, oo
ka ahaa reer Serax, oo isaga kooxdiisana waxaa ku jiray
afar iyo labaatan kun oo nin. **12** Oo sirkaalkii sagaalaad
ee bishii sagaalaad bixi jirayna wuxuu ahaa Abiiceser oo
ahaa reer Canaatood, oo ka ahaa reer Benyaamiin, oo
isaga kooxdiisana waxaa ku jiray afar iyo labaatan kun oo
nin. **13** Oo sirkaalkii tobnaad ee bishii tobnaad bixi jirayna
wuxuu ahaa Maharay oo ahaa reer Netofaah oo ka ahaa
reer Serax, oo isaga kooxdiisana waxaa ku jiray afar iyo
labaatan kun oo nin. **14** Oo sirkaalkii kow iyo tobnaad ee
bishii kow iyo tobnaad bixi jirayna wuxuu ahaa Benaayaah
oo ahaa reer Fircaatoon, oo ka ahaa reer Efrayim, oo
isaga kooxdiisana waxaa ku jiray afar iyo labaatan kun
oo nin. **15** Oo sirkaalkii laba iyo tobnaad ee bishii laba
iyo tobnaad bixi jirayna wuxuu ahaa Xelday oo ahaa reer
Netofaah, oo ka ahaa reer Cotnii'eel, oo isaga kooxdiisana
waxaa ku jiray afar iyo labaatan kun oo nin. **16** Oo weliba
waxaa qabiilooyinkii reer binu Israa'iil u talinayay kuwan:
reer Ruubeen waxaa u talinayay Eliiceser ina Sikrii oo taliye
ahaa, reer Simecoonna waxaa u talinayay Shefatyaah ina
Macakaah, **17** reer Laawina waxaa u talinayay Hashabyaah
ina Qemuu'eel, reer Haaruunna waxaa u talinayay Saadooq,
**18** reer Yahuudahna waxaa u talinayay Eliihuu, oo Daa'uud
walaalihiis ka mid ahaa, reer Isaakaarna waxaa u talinayay
Coomrii ina Miikaa'eel, **19** reer Sebulunna waxaa u talinayay
Yishmacyaah ina Cobadyaah, reer Naftaalina waxaa u
talinayay Yereemood ina Casrii'eel, **20** reer Efrayimna waxaa
u talinayay Hoosheeca ina Casasyaah, oo reer Manaseh
badhkiisna waxaa u talinayay Yoo'eel ina Fedaayaah, **21** reer
Manaseh badhkiisii kale oo joogay dalka Gilecaadna waxaa
u talinayay Iddo ina Sekaryaah, reer Benyaamiinna waxaa
u talinayay Yacasii'eel ina Abneer, **22** reer Daanna waxaa
u talinayay Casareel ina Yeroxaam. Oo kuwaasu waxay
ahaayeen saraakiishii qabiilooyinka reer binu Israa'iil. **23**
Laakiinse Daa'uud ma uu tirinin intoodii labaatan sannadood
ka yarayd, maxaa yeelay, Rabbigu wuxuu yidhi inuu reer
binu Israa'iil u badinayo sida xiddigaha samada oo kale.
**24** Yoo'aab oo ay Seruuyaah dhashay ayaa bilaabay inuu
dadka tirsho, laakiinse ma uusan dhammayn, oo tirintaas
aawadeed ayaa reer binu Israa'iil cadho ugu soo degtay, oo
tiradiina laguma darin xisaabtii kitaabkii taariikhda oo Boqor
Daa'uud. **25** Oo boqorka khasnadihiisana waxaa u talinayay
Casmaawed ina Cadii'eel, oo guryihii wax lagu kaydiyey
ee beeraha ku yiil, iyo kuwii ku yiil magaalooyinka, iyo
tuulooyinka, iyo qalcadahaba waxaa u talinayay Yoonaataan
ina Cusiyaah. **26** Oo kuwii samayn jiray shuqulka beeraha
inay dhulka qodaanna waxaa u talinayay Cesrii ina Keluub.

27 Oo beeraha canabka ahna waxaa u talinayay Shimcii
oo ahaa reer Raamad, oo guryihii lagu kaydiyey khamrigii
laga helay beeraha canabka ahna waxaa u talinayay Sabdii
oo ahaa reer Shifmii. 28 Oo dhirtii saytuunka ahayd iyo
dhirtii darayga ahayd oo dalkii dooxada ahaa ku yiilna waxaa
u talinayay Bacal Xaanaan oo ahaa reer Geder, guryihii
saliidda lagu kaydiyeyna waxaa u talinayay Yoo'aash. 29 Oo
lo'dii Shaaroon daaqi jirtayna waxaa u talinayay Shitray oo
ahaa reer Shaaroon, oo lo'dii dooxooyinka joogtayna waxaa
u talinayay Shaafaad ina Adlay. 30 Oo geelashana waxaa u
talinayay Oobiil oo ahaa reer Ismaaciil, oo dameerahana
waxaa u talinayay Yexdeyaah oo ahaa reer Meeronotii, 31 oo
adhyahana waxaa u talinayay Yaasiis oo ahaa reer Hagrii.
Oo kulli intaas oo dhammu waxay ahaayeen taliyayaashii
maalkii Boqor Daa'uud. 32 Oo weliba Yoonaataan oo ahaa
Daa'uud adeerkiis wuxuu ahaa lataliye waxgarasho weyn
leh, iyo karraaniba, oo Yexii'eel ina Xakmooniina wuxuu
la jiray boqorka wiilashiisa. 33 Oo Axiitofelna wuxuu ahaa
boqorka lataliyihiisa, oo Xuushay oo ahaa reer Arkiina wuxuu
ahaa boqorka saaxiibkiis. 34 Oo Axiitofelna waxaa ku xigay
Yehooyaadaac ina Benaayaah, iyo Aabyaataar, oo boqorka
ciidankiisana waxaa sirkaal u ahaa Yoo'aab.

**28** Markaasaa Daa'uud wuxuu Yeruusaalem ku soo wada
shiriyey amiirradii reer binu Israa'iil oo dhan, iyo
amiirradii qabiilooyinka, iyo saraakiishii kooxihii boqorka mile
milaha ugu adeegi jiray, iyo kuwii kun kun u talin jiray iyo kuwii
boqol boqol u talin jiray, iyo taliyayaashii xukumi jiray maalka
iyo hantidii boqorka iyo tii wiilashiisaba, iyo saraakiishii iyo
raggii xoogga badnaa, xataa kulli raggii xoogga badnaa oo
dhanba. 2 Markaasaa Boqor Daa'uud cagaha isku taagay,
oo wuxuu yidhi, Walaalahay iyo dadkaygiiyow, i maqla.
Aniga waxaa qalbigayga ku jirtay inaan guri nasasho u
dhiso sanduuqa axdiga Rabbiga iyo meel uu Ilaaheennu
cago saaro, oo dhismihiina alaab baan u diyaariyey. 3
Laakiinse Ilaah baa igu yidhi, Waa inaadan guri u dhisin
magacayga aawadiis, maxaa yeelay, waxaad tahay nin
dagaal, oo dhiig baad daadisay. 4 Habase yeeshee Rabbiga
Ilaaha reer binu Israa'iil ahu wuxuu iga doortay reerkii
aabbahay oo dhan inaan weligay ahaado boqor reer binu
Israa'iil u taliya, waayo, isagu wuxuu Yahuudah u doortay
inuu amiir ahaado, oo reer Yahuudahna wuxuu ka doortay
reerkii aabbahay, oo wiilashii aabbahayna aniguu igala dhex
baxay oo igu farxay inuu iga dhigo boqor u taliya reer binu
Israa'iil oo dhan. 5 Rabbigu wiilal badan buu i siiyey oo
wuxuu wiilashaydii oo dhan ka doortay wiilkayga Sulaymaan
inuu carshiga boqortooyada Rabbiga ku fadhiisto oo uu
reer binu Israa'iil u taliyo. 6 Oo wuxuu igu yidhi, Wiilkaaga
Sulaymaan ayaa dhisi doona gurigayga iyo barxadahaygaba,
waayo, waxaan isaga u doortay inuu ahaado wiilkaygii, oo
anna waxaan isaga u ahaan doonaa aabbihiis. 7 Oo anigu
boqortooyadiisaan xoogayn doonaa weligeed, hadduu ku sii
adkaado inuu sameeyo amarradayda iyo xukummadayda,
siday maantadan tahay. 8 Haddaba sidaas daraaddeed reer
binu Israa'iil oo dhan oo ah shirkii Rabbiga hortooda, iyo
iyadoo uu Ilaaheennu ina maqlayo, dhawra oo doondoona
amarrada Rabbiga Ilaaheenna ah oo dhan inaad idinku
hantidaan dalkan wanaagsan oo aad weliba carruurtiinna
idinka dambaysana uga tagtaan dhaxal weligiis raagaya.
9 Haddaba Sulaymaanow, wiilkaygiiyow, Ilaahii aabbahaa
garo, oo ugu adeeg qalbi qumman iyo maan raalli ah, waayo,
Rabbigu wuxuu baadhaa qalbiyada oo dhan, wuuna wada
gartaa malayaasha fikirrada oo dhan, oo haddaad isaga
doondoontid waad heli doontaa, laakiinse haddaad isaga
ka tagtid wuu ku xoori doonaa weligaaba. 10 Haddaba
iska jir, waayo, Rabbigu wuxuu kuu doortay inaad meesha
quduuska ah guri u dhistid. Xoog yeelo oo samee. 11
Markaasaa Daa'uud wiilkiisii Sulaymaan siiyey tilmaantii
balbaladii macbudka, iyo tii guryihiisa, iyo tii khasnadihiisa,
iyo tii qowladihiisa sare, iyo tii qolalkiisa hoose, iyo tii
meeshii daboolka kafaaraggudka. 12 Oo wuxuu kaloo
siiyey kulli wixii uu ruuxii ku hayay tilmaantoodii oo dhan,
kuwaasoo ah barxadihii guriga Rabbiga, iyo qolalkii ku
wareegsanaa oo dhan, iyo khasnadihii guriga Ilaah, iyo
khasnadihii alaabta quduuska ah la dhigi lahaa, 13 iyo
weliba tilmaantii kooxihii ahaa wadaaddada iyo reer Laawi,
iyo shuqulkii laga qaban lahaa guriga Rabbiga oo dhan,
iyo weelashii guriga lagaga adeegi lahaa oo dhan, 14 iyo
tilmaantii dahabkii loo miisaami lahaa weelasha dahabka
ah, oo ah kulli weelasha lagu adeegi lahaa cayn kasta oo
adeegid ah, iyo tii lacagtii loo miisaami lahaa kulli weelasha
lacagta ah oo ah kulli weelasha lagu adeegi lahaa cayn
kasta oo adeegid ah, 15 iyo weliba tii dahabkii loo miisaami
lahaa laambadaha dahabka ah, iyo laambadahooda yaryar
ee dahabka ah oo dhan, laambad kasta iyo laambadaheeda
yaryarba miisaankooda, iyo tii lacagtii loo miisaami lahaa
laambadaha lacagta ah, laambad kasta iyo laambadaheeda
yaryarba miisaankooda, si waafaqsan wixii laambad kasta
lagu qaban lahaa, 16 iyo tii dahabkii loo miisaami lahaa
miisaska kibista tusniinta, miis kasta miisaankiisa, iyo tii
lacagtii miisaska lacagta ah, 17 iyo tilmaantii mudacyada,
iyo maddiibadaha, iyo koobabka laga samayn lahaa dahab
saafi ah, oo baaquliyada dahabka ahna baaquli kasta
dahabkiisii miisaankiisa, oo baquliyada lacagta ahna baquli

kasta lacagtiisii miisaankeeda, 18 iyo tilmaantii girgiraha
fooxa dahabkiisa la safeeyey miisaankiisa, iyo tilmaantii
dahabka loo miisaami lahaa naqshadda gaadhifaraska,
iyo keruubiimtii baalashooda kala bixisay oo ku qarisay
sanduuqii axdiga Rabbiga. 19 Oo Daa'uud wuxuu yidhi,
Waxan oo dhan waxaa laygu garansiiyey qorniin laga helay
gacantii Rabbiga, si aan ku garto tilmaantan shuqulkeeda oo
dhan. 20 Markaasaa Daa'uud wuxuu wiilkiisii Sulaymaan ku
yidhi, Xoog yeelo oo aad u dhiirranow, oo hawshan samee,
oo ha cabsan, hana qalbi jabin, waayo, Rabbiga Ilaaha
ah oo ah Ilaahayga ayaa kula jira, oo isagu kuma gabi
doono, kumana dayrin doono, jeer la wada dhammeeyo kulli
shuqulka adeegidda guriga Rabbiga oo dhan. 21 Oo bal eeg,
waxaa jooga kooxaha ah wadaaddada iyo reer Laawi, inay
dhammaan qabtaan adeegidda guriga Ilaah, oo waxaa kula
jiri doona oo hawl kasta qaban doona nin kasta oo adeegid
kasta sanco u yaqaan oo raalli ah, oo weliba saraakiisha iyo
dadka oo dhammuna amarkaaga way oggolaan doonaan.

**29** Markaasaa Boqor Daa'uud shirkii oo dhan ku yidhi,
Wiilkayga Sulaymaan oo Ilaahu keligiis doortay, weli
wuu yar yahay, waana tabar daranyahay, oo shuqulkuna
waa weyn yahay, waayo, guriga nin loo dhisi maayo,
laakiinse waxaa loo dhisayaa Rabbiga Ilaaha ah. 2 Haddaba
xooggaygii oo dhan ayaan gurigii Ilaahayga u diyaarshay
dahabka laga sameeyo alaabta dahabka, iyo lacagta laga
sameeyo alaabta lacagta ah, iyo naxaasta laga sameeyo
alaabta naxaasta ah, iyo birta laga sameeyo alaabta birta
ah, iyo qoriga laga sameeyo alaabta qoriga ah, iyo dhagaxyo
onika la yidhaahdo, iyo dhagaxyada la dejiyo oo wax lagu
qurxiyo oo midabyo kala cayncayn ah, iyo cayn kasta oo
dhagaxyo qaaliya ah, iyo dhagaxyo badan oo marmar ah. 3
Oo weliba anigu aad baan u jeclahay guriga Ilaahayga, oo
taas daraaddeed waxaan guriga Ilaahayga siinayaa khasnad
mulkigayga ah oo dahab iyo lacag ah, taasoo aan ku jirin
wixii aan u diyaariyey gurigii quduuska ah, 4 waxa weeye
saddex kun oo talanti oo dahab ah oo weliba ah dahabkii
Oofir, iyo toddoba kun oo talanti oo ah lacag la safeeyey,
in lagu dahaadho guryaha derbiyadoodii oo dhan, 5 iyo
in dahab laga sameeyo alaab dahab ah, iyo in lacag laga
sameeyo alaab lacag ah, iyo shuqul kasta oo ay kuwa
sancada yaqaan gacmahooda ku qabtaan. Haddaba yaa
raalli ka ah oo maantadan nafsaddiisa Rabbiga u bixinaya?
6 Markaas amiirradii reeraha iyo amiirradii qabiilooyinka
reer binu Israa'iil iyo kuwii kun kun u taliyey, iyo kuwii
boqol boqol u taliyey, iyo taliyayaashii boqorka hawshiisa
xukumi jirayba waxay bixiyeen wax ay raalli ka yihiin. 7
Oo adeegidda guriga Ilaah daraaddeed waxay u bixiyeen
shan kun oo talanti iyo toban kun oo dirham oo dahab ah,
iyo toban kun oo talanti oo lacag ah, iyo siddeed iyo toban
kun oo talanti oo naxaas ah, iyo boqol kun oo talanti oo bir
ah. 8 Oo kuwii dhagxanta qaaliga ah laga helayna waxay
siiyeen khasnaddii guriga Rabbiga, waxaana loo dhiibay
gacantii Yexii'eel oo ahaa reer Gershoon. 9 Markaasaa
dadkii aad ugu farxay raallinimadii ay raalligooda wax ku
bixiyeen aawadeed, maxaa yeelay, iyagu qalbi qumman
ayay Rabbiga wax ugu bixiyeen iyagoo raalli ka ah, oo
Boqor Daa'uudna farxad weyn buu farxay. 10 Haddaba
sidaas daraaddeed ayaa Daa'uud Rabbiga ku ammaanay
shirkii oo dhan hortiisa, oo yidhi, Rabbiyow, awowgayo
Israa'iil Ilaahiisiiyow, weligaa iyo weligaaba ammaanu ha kuu
ahaato. 11 Rabbiyow, weynaanta, iyo xoogga, iyo ammaanta,
iyo guusha, iyo haybaddaba adigaa iska leh, waayo, waxa
samada ku jira oo dhan iyo waxa dhulka saaranba adigaa
iska leh. Rabbiyow, boqortooyada adigaa iska leh, oo adiga
waxaa laguu sarraysiiyaa sidii madax wax kasta ka sarreeya.
12 Oo maal iyo sharafuba xaggaagay ka yimaadaan, oo
wax kasta adigaa u taliya, oo gacantaadana waxaa ku jira
xoog iyo itaal, oo gacantaada weeye midda wax weynayn
karta oo qof kastaba xoog siin karta. 13 Haddaba sidaas
daraaddeed, Ilaahayagiiyow, waannu kugu mahadnaqaynaa,
oo magacaaga haybadda badanna waannu ammaanaynaa.
14 Laakiinse bal anigu yaan ahay, dadkayguse waa ayo,
inaan annagu awoodno inaan sidan wax u bixinno annagoo
raalli ka ah? Waayo, wax kastaaba xaggaagay ka yimaadeen,
oo annana waxaagii baan wax ka siinnay. 15 Waayo, annagu
hortaada waxaannu ku nahay shisheeyayaal sodcaal ah, sidii
awowayaashayo oo dhammu ay ahaan jireen, oo cimrigayaga
aan dhulka joognaana waa sida hoos oo kale, oo wax la
filayaana ma jiro. 16 Rabbiyow Ilaahayagiiyow, kaydkan
aannu u diyaarinnay inaan guri ugu dhisno magacaaga
quduuska ah dhammaantiis wuxuu ka yimid gacantaada
oo kulligiisna adigaa iska leh. 17 Weliba waan ogahay,
Ilaahayow, inaad qalbiga imtixaantid, oo aad qummanaanta
ku faraxdid. Oo aniguna iyadoo qalbigaygu qumman yahay
ayaan waxyaalahan oo dhan bixiyey anigoo raalli ah, oo
haddana farxad baan ku arkay dadkaaga halkan jooga oo
wax bixinaya iyagoo raalli ah. 18 Rabbiyow, awowayaashayo
Ibraahim iyo Isxaaq iyo Israa'iil Ilaahoodiiyow, weligaaba
saas ka yeel malayaasha fikirrada qalbiga dadkaaga, oo
qalbigoodana xaggaaga u soo toosi. 19 Oo wiilkayga
Sulaymaanna waxaad siisaa qalbi qumman oo uu ku dhawro
amarradaada iyo markhaatigaaga iyo qaynuunnadaada, inuu
waxyaalahan oo dhan sameeyo, iyo inuu dhiso gurigii aan

wax u sii diyaarshay. 20 Markaasaa Daa'uud wuxuu shirkii
oo dhan ku yidhi, Haddaba Rabbiga Ilaahiinna ah ammaana.
Kolkaasay shirkii oo dhammu ammaaneen Rabbiga ah
Ilaaha awowayaashood, oo intay madaxa foororiyeen ayay
u sujuudeen Rabbiga iyo boqorkaba. 21 Oo subaxdii
maalintaas ka dambaysay ayay Rabbiga u bixiyeen allabaryo
iyo qurbaanno la gubo oo ah kun dibi, iyo kun wan, iyo kun
baraar ah, iyo qurbaannadooda cabniinka ah, iyo allabaryo
tiro badan oo reer binu Israa'iil oo dhan loo bixiyey. 22 Oo
maalintaas iyagoo aad u faraxsan ayay Rabbiga hortiisa wax
ku cuneen oo wax ku cabbeen. Oo Sulaymaan ina Daa'uud
ayay mar labaad boqreen, oo isaga Rabbiga ugu subkeen
inuu madax ahaado, Saadooqna inuu wadaad ahaado. 23
Markaasaa Sulaymaan carshigii Rabbiga ku fadhiistay isagoo
jagadii aabbihiis Daa'uud boqor ka ah, wuuna barwaaqoobay,
oo reer binu Israa'iil oo dhammuna isagay addeeceen. 24
Oo amiirradii oo dhan iyo raggii xoogga badnaa iyo Boqor
Daa'uud wiilashiisii kale oo dhammuba Boqor Sulaymaan
ayay addeeceen oo ka wada dambeeyeen. 25 Oo Rabbiguna
Sulaymaan aad iyo aad buu ugu weyneeyey reer binu
Israa'iil oo dhan hortooda, oo wuxuu isaga siiyey boqortooyo
haybad leh oo ayan lahaan jirin boqorradii reer binu Israa'iil
oo isaga ka horreeyey oo dhammu. 26 Haddaba Daa'uud
ina Yesay wuxuu boqor u ahaan jiray reer binu Israa'iil oo
dhan. 27 Oo wakhtigii uu reer binu Israa'iil boqor u ahaana
wuxuu ahaa afartan sannadood; toddoba sannadood ayuu
Xebroon boqor ka ahaa, saddex iyo soddon sannadoodna
wuxuu boqor ka ahaa Yeruusaalem. 28 Oo wuxuu dhintay
isagoo oday ah oo ka dhergay cimri, iyo maal, iyo sharafba,
oo waxaa meeshiisii boqor ka noqday wiilkiisii Sulaymaan.
29 Haddaba Boqor Daa'uud falimihiisii, intii hore iyo intii
dambeba, waxay ku qoran yihiin taariikhdii Samuu'eel oo
wax arke ahaa, iyo taariikhdii Nebi Naataan, iyo taariikhdii
Gaad oo isna wax arke ahaa. 30 Oo waxaa halkaas ku
qoran kulli wakhtiyadii ay soo mareen boqortooyadiisii iyo
xooggiisii, iyo wakhtiyadii ay isaga iyo reer binu Israa'iil, iyo
boqortooyooyinkii waddammada oo dhammuba soo mareen.

# Taariikhdii Labaad

1 Oo Sulaymaan ina Daa'uud boqortooyadiisuu ku
xoogaystay, oo Rabbigii Ilaahiisa ahaa waa la jiray oo
aad iyo aad buuna u weyneeyey. 2 Oo Sulaymaan baa la
hadlay reer binu Israa'iil oo dhan oo ahaa kuwii kun kun u
talin jiray, iyo kuwii boqol boqol u talin jiray, iyo xaakinnadii,
iyo amiir kasta oo dalka reer binu Israa'iil joogay kuwaasoo
ahaa madaxdii reeraha. 3 Markaasaa Sulaymaan iyo shirkii
isaga la jiray oo dhammu waxay tageen meeshii sare oo
Gibecoon ku tiil, waayo, halkaas waxaa tiil teendhadii shirka
oo Rabbiga, taasoo Muuse oo ahaa Rabbiga addoonkiisii
uu cidlada ku sameeyey. 4 Laakiinse sanduuqii axdiga
Ilaah Daa'uud baa ka soo qaaday Qiryad Yecaariim oo
wuxuu keenay meeshii Daa'uud u diyaariyey, waayo, isagu
Yeruusaalem ayuu teendho uga dhisay. 5 Oo weliba meeshii
allabariga ee naxaasta ahayd oo uu Besaleel ina Uurii
oo ahaa reer Xuur sameeyey halkaasay tiil taambuugga
Rabbiga hortiisa. Oo halkaasay Sulaymaan iyo shirkiiba
Rabbiga ka doonayeen. 6 Markaasaa Sulaymaan kor ugu
baxay meeshii allabariga ee naxaasta ahayd oo Rabbiga
hor tiil, taasoo teendhadii shirka hor qotontay, oo wuxuu
ku dul bixiyey kun qurbaan oo la gubo. 7 Oo habeenkaas
ayaa Ilaah Sulaymaan u muuqday oo ku yidhi, I bari waxaad
doonaysid aan ku siiyee. 8 Markaasaa Sulaymaan Ilaah ku
yidhi, Aabbahay Daa'uud si weyn baad ugu naxariisatay,
anigana boqor baad igaga dhigtay meeshiisii. 9 Haddaba
Rabbiyow Ilaahow, ballankaagii aad aabbahay Daa'uud u
ballanqaadday ha dhismo, waayo, waxaad boqor iiga dhigtay
dad tiradiisu tahay sida ciidda dhulka. 10 Haddaba waxaad i
siisaa xigmad iyo aqoon si aan dadkan hortooda ugu baxo
oo ugu soo galo, waayo, dadkaagan tirada badan bal yaa
xukumi kara? 11 Markaasaa Ilaah wuxuu Sulaymaan ku
yidhi, Waxyaalaha qalbigaaga ku jiray aawadood oo ah
adigoo aan i weyddiisan maal, iyo hodan, amase sharaf,
amase kuwa adiga ku neceb noloshooda, ama aadan i
weyddiisan cimri dheer, laakiinse aad i weyddiisatay xigmad
iyo aqoon aad ku xukuntid dadkayga aan boqorka kaaga
dhigay, 12 ayaa xigmad iyo aqoonba lagu siiyey, oo anna
waxaan ku siinayaa maal, iyo hodan, iyo sharaf ayan lahaan
jirin boqorradii kaa horreeyey oo dhammu, oo ayan kuwa
kaa dambeeya oo dhammuna taasoo kale lahaan doonin.
13 Markaasaa Sulaymaan ka soo noqday meeshii sare oo
Gibecoon ku tiil iyo teendhadii shirka, oo yimid Yeruusaalem,
reer binu Israa'iil buuna boqor u noqday. 14 Sulaymaanna
wuxuu urursaday gaadhifardood iyo rag fardooley ah,
oo wuxuu lahaa kun iyo afar boqol oo gaadhifaras, iyo
laba iyo toban kun oo nin oo fardooley ah, oo wuxuu
fadhiisiyey magaalooyinkii gaadhifardoodka, oo qaarna
boqorkay Yeruusaalem la joogeen. 15 Oo boqorku wuxuu
lacag iyo dahabba Yeruusaalem kaga dhigay sida dhagaxyo
oo kale. Oo geedo kedar ahna wuxuu u soo badiyey oo ka
dhigay sida geedaha darayga ah oo dhulka hoose ka baxa
oo kale. 16 Oo Sulaymaan farduhuu haystayna waxaa laga
keenay dalka Masar, oo boqorka baayacmushtariyaashiisii
ayaa raxan raxan u soo kaxeeyey iyagoo raxanba iib gaar
ah siiyey. 17 Oo gaadhifaras wuxuu Masar kaga soo bixi jiray
lix boqol oo sheqel oo lacag ah, farasna boqol iyo konton
sheqel; oo saasoo kalay ugu wada keeni jireen boqorradii
reer Xeed oo dhan iyo boqorradii reer Suuriyaba.

2 Haddaba Sulaymaan wuxuu u qasdiyey inuu guri u dhiso
Rabbiga magiciisa, iyo guri kale oo boqortooyadiisu
leedahay. 2 Markaasaa Sulaymaan wuxuu qortay
toddobaatan kun oo xammaal, iyo siddeetan kun oo nin
oo buuraha dhagax ka jari jiray, iyo saddex kun iyo lix
boqol oo nin oo iyaga u taliya. 3 Oo Sulaymaanna wuxuu
u cid diray Xuuraam oo ahaa boqorkii Turos oo ku yidhi,
Sidaad u yeeshay aabbahay Daa'uud markaad isaga u
soo dirtay alwaax kedar ah oo uu ku dhisto guri uu ku
hoydo, anigana sidii oo kale ii yeel. 4 Bal eeg, waxaan
guri u dhisayaa magaca Rabbiga Ilaahayga ah, inaan isaga
quduus uga dhigo, oo hortiisa lagu shido foox udgoon, oo
la hor dhigo kibista tusniinta oo joogtada ah, oo la bixiyo
qurbaannada la gubo subaxda iyo fiidka, iyo Sabtiyada,
iyo markay bilaha cusubu dhashaan, iyo ciidaha Rabbiga
Ilaahayaga ah. Kaasuna waa amar reer binu Israa'iil weligiis
la amray. 5 Oo guriga aan dhisayaana waa weyn yahay,
maxaa yeelay, Ilaahayagu waa weyn yahay oo waa ka
wada sarreeyaa ilaahyada oo dhan. 6 Laakiinse bal yaa
isaga guri u dhisi kara, maxaa yeelay, samada iyo samada
samooyinkuba isaga ma qaadi karaan? Bal markaan guri
u dhisayo, yaan ahay anigu, inaan hortiisa foox ku shido
oo keliya mooyaane? 7 Haddaba waxaad ii soo dirtaa nin
yaqaan sancada dahabka, iyo lacagta, iyo naxaasta, iyo birta,
iyo guduudka, iyo casaanka, iyo buluugga, kaasoo si wacan
u yaqaan sancada xaradhka, inuu la jiro ragga saanacyada
ah oo ila jooga dalka Yahuudah iyo Yeruusaalem, kuwaasoo
uu aabbahay Daa'uud diyaariyey. 8 Oo weliba waxaad
dalka Lubnaan iiga soo dirtaa geedo kedar ah iyo geedo
beroosh ah iyo geedo almuug ah, waayo, waan ogahay in
addoommadaadu sanco u leeyihiin inay Lubnaan alwaax
ka soo jaraan, oo bal eeg addoommadayduna waxay la
jiri doonaan addoommadaada, 9 si ay iigu diyaariyaan

alwaax faro badan, waayo, guriga aan dhowaan dhisi doonaa
wuxuu ahaan doonaa mid yaab weyn oo badan. **10** Oo bal
eeg, anigu addoommadaada alwaaxda jaraya waxaan siin
doonaa labaatan kun oo kor oo ah sarreen la tumay, iyo
labaatan kun oo kor oo ah shaciir, iyo labaatan kun oo bad
oo khamri ah, iyo labaatan kun oo bad oo saliid ah. **11**
Markaasaa Xuuraam oo ahaa boqorkii Turos wuxuu ku soo
jawaabay warqad uu u soo qoray Sulaymaan oo wuxuu ku
yidhi, Rabbigu dadkiisa waa jecel yahay, sidaas daraaddeed
buu boqor kaaga dhigay. **12** Oo weliba Xuuraam wuxuu
kaloo yidhi, Ammaan waxaa leh Rabbiga ah Ilaaha reer
binu Israa'iil oo sameeyey samada iyo dhulkaba, oo Boqor
Daa'uudna siiyey wiil xigmad leh oo ay ka buuxaan caqli iyo
waxgarasho oo doonaya inuu Rabbiga guri u dhiso iyo guri
ay boqortooyadiisu leedahay. **13** Oo haddaba waxaan kuu
soo diray nin saanac ah oo waxgarad miidhan ah kaasoo
ah Xuuraamaabbii. **14** Oo isaga waxaa dhashay naag reer
Daan ah oo aabbihiisna wuxuu ahaa nin reer Turos ah.
Isagu wuxuu yaqaan sancada dahabka, iyo lacagta, iyo
naxaasta, iyo birta, iyo dhagaxa, iyo alwaaxda, iyo guduudka,
iyo buluugga, iyo dharka wanaagsan, iyo casaanka, oo
weliba wuxuu yaqaan inuu xaradh cayn kasta ah xardho
iyo inuu wax kasta hindiso; haddaba isaga meel ha laga
dhex siiyo raggaaga saanacyada ah iyo sayidkayga Daa'uud
oo aabbahaa ah raggiisa saanacyada ah. **15** Haddaba
sarreenkii iyo shaciirkii, iyo saliiddii iyo khamrigii aad ka
hadashay noo soo dir, sayidkaygiiyow. **16** Oo annana in
alla intaad u baahan tahay oo alwaax ah ayaannu Lubnaan
kaaga soo jaraynaa; oo Yaafaa xaggeeda ayaannu badda
kuu soo sabbaysiinaynaa, markaasaad Yeruusaalem u
qaadan doontaa. **17** Markaasaa Sulaymaan wada tiriyey
shisheeyayaashii dalka Israa'iil degganaa oo dhan, oo wuxuu
u tiriyey sidii aabbihiis Daa'uud u tiriyey oo kale, oo waxay
noqdeen boqol iyo saddex iyo konton kun iyo lix boqol oo
qof. **18** Oo wuxuu iyagii ka dhigay toddobaatan kun oo
xammaal, iyo siddeetan kun oo nin oo buuraha geedo ka
jara, iyo saddex kun iyo lix boqol oo nin oo dadka u taliya oo
shuqulka u dira.

**3** Markaasaa Sulaymaan bilaabay inuu gurigii Rabbiga
Yeruusaalem ka dhiso oo ka dul dhiso Buur Moriyaah oo
ahayd meeshii Rabbigu ugu muuqday aabbihiis Daa'uud,
oo wuxuu wax ku diyaarshay meeshii Daa'uud doortay oo
ahayd meeshii wax lagu tumi jiray oo uu Aarnaankii reer
Yebuus lahaa. **2** Oo wuxuu dhismihii bilaabay sannaddii
afraad oo boqortooyadiisa, bisheedii labaad, maalinteedii
labaad. **3** Haddaba kanu waa aasaaskii Sulaymaan u dhigay
dhismihii guriga Ilaah. Oo dhererku markii cabbirkii hore lagu
xisaabo wuxuu ahaa lixdan dhudhun, oo ballaadhkiisuna
wuxuu ahaa labaatan dhudhun. **4** Oo balbaladii guriga ka
horraysayna dhererkeedu wuxuu le'ekaa guriga ballaadhkiisu
oo labaatan dhudhun ahaa, oo sarajooggeeduna wuxuu
ahaa boqol iyo labaatan dhudhun, oo wuxuu gudaha hoose
kaga dahaadhay dahab saafiya. **5** Oo gurigii weynaa
wuxuu saqaf hoose uga dhigay qoryo beroosh ah oo uu
dahab wanaagsan ku dahaadhay, oo wuxuuna ku xardhay
geedo timireed iyo silsilado. **6** Oo gurigiina wuxuu ku
qurxiyey dhagaxyo qaali ah, dahabkuna wuxuu ahaa dahabkii
Farwaayim. **7** Oo gurigiina iyo alwaaxdii saqafka haysay,
iyo fayaaradihiisii, iyo derbiyadiisii, iyo albaabbadiisiiba
wuxuu ku dahaadhay dahab, oo derbiyadana Keruubiim
buu ku xardhay. **8** Oo wuxuu sameeyey gurigii ugu wada
quduusnaa, dhererkiisuna wuxuu le'ekaa guriga ballaadhkiisa
oo labaatan dhudhun ahaa, oo ballaadhkiisuna wuxuu
ahaa labaatan dhudhun, oo isagana wuxuu ku dahaadhay
dahab wanaagsan oo gaadhaya lix boqol oo talanti. **9** Oo
musmaarrada miisaankooduna wuxuu ahaa konton sheqel
oo dahab ah, oo qolalkii sarena wuxuu ku dahaadhay
dahab. **10** Oo guriga ugu wada quduusan gudihiisana
wuxuu ku sameeyey laba keruub oo wax xardhan ah,
oo iyagana dahab baa lagu dahaadhay. **11** Keruubiimta
baalashooda dhererkooduna wuxuu ahaa labaatan dhudhun;
mid baalkiisu wuxuu ahaa shan dhudhun oo wuxuu gaadhi
karay guriga derbigiisa, oo kan kalena wuxuu ahaa shan
dhudhun sidaasoo kale oo wuxuu gaadhi karay baalka
keruubka kale. **12** Oo keruubka kale baalkiisuna wuxuu ahaa
shan dhudhun, oo wuxuu gaadhi karay guriga derbigiisa
kale; oo baalka kalena sidaasoo kale wuxuu ahaa shan
dhudhun oo wuxuu gaadhi karay baalka keruubka kale. **13**
Oo keruubiimtaas baalashoodu way kala baxsanaayeen
intii labaatan dhudhun ah; oo cagahooday ku taagnaayeen,
wejiyadooduna waxay u jeedeen guriga gudihiisa. **14** Oo
haddana wuxuu ilxidhka ka dhigay buluug, iyo guduud, iyo
casaan, oo maro wanaagsan laga sameeyey, oo keruubiim
lagu daabacay. **15** Oo weliba guriga hortiisana wuxuu ku
sameeyey laba tiir oo mid kasta dhererkiisu yahay shan iyo
soddon dhudhun, oo mid kastana taajkii saarnaa wuxuu
ahaa shan dhudhun. **16** Oo wuxuu kaloo sameeyey silsilado
u eg kuwii guriga quduuska ah markaasuu saaray tiirarka
dushoodii; oo wuxuu kaloo sameeyey boqol rummaan oo
silsiladihii buu ku dhejiyey. **17** Markaasuu tiirarkii qotomiyey
macbudka hortiisa, mid dhanka midigta, kii kalena dhanka
bidixda, oo kii dhanka midigta ahaa magiciisii wuxuu u

bixiyey Yaakiin, kii dhanka bidixda ahaana wuxuu u bixiyey
Bocas.

4 Oo weliba wuxuu kaloo sameeyey meel allabari oo
naxaas ah oo dhererkeedu labaatan dhudhun yahay,
ballaadhkeeduna labaatan dhudhun yahay, sarajooggeeduna
labaatan dhudhun yahay. 2 Oo wuxuu kaloo sameeyey
berkeddii naxaasta ahayd, oo qarkeedu gees ilaa
ka gees wuxuu isu jiray toban dhudhun, wayna
wareegsanayd, oo sarajooggeeduna wuxuu ahaa shan
dhudhun, wareeggeeduna wuxuu ahaa soddon dhudhun.
3 Oo hoosteedana waxaa ku yiil wax dibiyo u eg oo
ku wareegsanaa, dhudhunba toban, oo berkedda oo
dhan hareeraheeda ku wareegsanaa. Oo dibiyadu waxay
ahaayeen laba saf, oo markii berkeddii la shubay ayaa iyana
la shubay. 4 Oo berkeddu waxay dul saarnayd laba iyo
toban dibi, oo saddex waxay u jeedday xagga woqooyi,
saddexna waxay u jeedday xagga galbeed, saddexna
waxay u jeedday xagga koonfureed, saddexna waxay u
jeedday xagga bari; berkeddiina way dul saarnayd, oo dibidii
kulligood qaarkooda dambe wuxuu ku jiray gudaha. 5 Oo
berkeddii dhumucdeedu waxay ahayd taako; qarkeedana
waxaa loo sameeyey sidii koob qarkiis oo kale oo ubax
u ekaa; oo waxay qaadday saddex kun oo qiyaasood oo
bad la yidhaahdo. 6 Oo haddana wuxuu kaloo sameeyey
toban berkedood oo yaryar oo wax lagu maydho, oo shan
wuxuu dhigay dhanka midigta, shantii kalena wuxuu dhigay
dhanka bidixda, oo wixii allabari la gubo daraaddiis loo
bixinayoba iyagaa lagu dhex maydhi jiray; laakiinse berkeddii
weysada ahayd waxaa ku maydhan jiray wadaaddada oo
qudha. 7 Oo wuxuu kaloo sameeyey tobankii laambadood
oo dahabka ahaa, wuxuuna u sameeyey si waafaqsan
amarkii iyaga ku saabsanaa, oo iyagii wuxuu dhex qotomiyey
macbudka. Shan wuxuu dhigay dhanka midigta, shanna
wuxuu dhigay dhanka bidixda. 8 Oo haddana wuxuu kaloo
sameeyey toban miis, oo iyagiina wuxuu dhex dhigay
macbudka. Shan wuxuu dhigay dhanka midigta, shanna
wuxuu dhigay dhanka bidixda. Oo wuxuu kaloo sameeyey
boqol maddiibadood oo dahab ah. 9 Oo weliba wuxuu kaloo
sii sameeyey barxaddii wadaaddada, iyo barxaddii weynayd,
iyo albaabbadii barxadda, oo albaabbadoodiina wuxuu
ku dahaadhay naxaas. 10 Oo berkeddii weysada ahayd
wuxuu dhigay guriga dhankiisa midigta oo ah xagga bari-
koonfureed. 11 Oo Xuuraamna wuxuu sameeyey dheryihii iyo
majarafadihii iyo maddiibadihii. Oo Xuuraamna sidaasuu u
dhammeeyey shuqulkii uu Boqor Sulaymaan ugu sameeyey
guriga Ilaah, 12 kaasoo ahaa labadii tiir, iyo fijaannadii, iyo
labadii taaj oo tiirarkii kor saarnayd, iyo labadii shabag oo ku
dednaa labada fijaan oo taajajkii tiirarka kor saarnaa; 13
iyo afartii boqol oo rummaan ee labadii shabag lahaayeen,
oo shabag kastaa wuxuu lahaa laba saf oo rummaan
ah si ay u dedaan labadii fijaan ee taajajkii tiirarka kor
saarnaa. 14 Oo isagu wuxuu kaloo sameeyey saldhigyadii,
iyo berkedihii saldhigyadii dul saarnaa, 15 oo wuxuu
kaloo sameeyey berkeddii weynayd iyo laba iyo tobankii
dibi ee iyada ka hooseeyey. 16 Oo weliba dheryihii, iyo
majarafadihii, iyo mudacyadii, iyo weelashooda oo dhanba
ayaa Xuuraamaabbii Boqor Sulaymaan ugu sameeyey guriga
Rabbiga aawadiis oo wuxuu ka wada sameeyey naxaas
dhalaasha. 17 Oo boqorku wuxuu alaabtaas ku shubay
Bannaankii Webi Urdun oo dhoobada lahaa ee u dhexeeyey
Sukod iyo Sereedaataah. 18 Oo Sulaymaanna weelashaas
oo dhan wuxuu u sameeyey si faro badan, waayo, naxaasta
miisaankeedii lama hubin. 19 Oo Sulaymaan baa sameeyey
weelashii guriga Ilaah tiil oo dhan, iyo weliba girgirihii
dahabka ahaa, iyo miisaskii ay kibistii tusniintu saarnayd, 20
iyo laambadihii, iyo laambadahoodii yaryaraa oo wada ahaa
dahab saafi ah in meesha ugu quduusan horteeda lagu
shido sida waafaqsan amarkii iyaga ku saabsanaa, 21 iyo
ubaxyadii, iyo laambadihii, iyo birqaabyadii dahabka ahaa, oo
dhammaantood wuxuu ka sameeyey dahab aad saafi u ah.
22 Oo alaabtii laambadihii lagu safeeya, iyo maddiibadihii,
iyo malgacadihii, iyo idammadiiba wuxuu ka wada sameeyey
dahab saafi ah; oo meeshii guriga laga soo geli jirayna, taas
oo ahayd meesha quduuska ah albaabbadeedii hoose, iyo
albaabbadii guriga macbudka ahba waxay wada ahaayeen
dahab.

5 Oo saasuu ku wada dhammaaday shuqulkii uu Boqor
Sulaymaan u sameeyey guriga Rabbiga. Oo Sulaymaanna
wuxuu soo geliyey alaabtii aabbihiis Daa'uud quduuska
ka dhigay ee ahayd lacagtii, iyo dahabkii, iyo weelashii,
oo wuxuu ku riday khasnadihii guriga Ilaah. 2 Markaasaa
Boqor Sulaymaan wuxuu Yeruusaalem isugu soo shiriyey
odayaashii reer binu Israa'iil, iyo qabiilooyinka madaxdoodii
oo dhan, oo ahaa amiirradii jilibyadii reer binu Israa'iil inay
sanduuqii axdiga Rabbiga ka soo qaadaan magaaladii
Daa'uud oo Siyoon ahayd. 3 Oo raggii reer binu Israa'iil
oo dhammu waxay u soo shireen boqorkii wakhtigii iidda
ah bisha toddobaad. 4 Oo odayaashii reer binu Israa'iil
oo dhammu way yimaadeen, markaasay kuwii reer Laawi
sanduuqii axdiga soo qaadeen. 5 Oo way keeneen sanduuqii
axdiga, iyo teendhadii shirka, iyo kulli weelashii quduuska
ahaa oo teendhada ku jiray oo dhan; oo intaas oo dhan

waxaa soo qaaday wadaaddadii reer Laawi. 6 Oo Boqor
Sulaymaan iyo shirkii reer binu Israa'iil oo isaga u soo ururay
oo dhammu waxay wada joogeen sanduuqii hortiisa, iyagoo
ku allabaryaya ido iyo dibi aan la sheegi karin ama aan
farahooda la tirin karin. 7 Oo wadaaddadiina sanduuqii
axdiga Rabbiga ayay meeshiisii keeneen, oo waxay soo
geliyeen guriga qolkiisii quduuska ahaa oo ahaa meeshii
ugu wada quduusnayd, taasoo ah keruubiimta baalashooda
hoostooda. 8 Waayo, keruubiimtu baalashoodii way ku kor
fidiyeen meeshii sanduuqa, oo ku qariyeen sanduuqii iyo
ulihiisiiba. 9 Oo uluhuna aad bay u dhaadheeraayeen, sidaas
daraaddeed dabadooda waxaa laga arki jiray sanduuqii ka
horreeya meesha ugu wada quduusan, laakiinse dibadda
kama ay muuqan; oo halkaasuu yaal ilaa maantadan. 10 Oo
sanduuqiina waxba kuma jirin labadii loox ee dhagaxa ahayd
oo Muuse isagoo Xoreeb jooga ku riday markii Rabbigu
axdiga la dhigtay reer binu Israa'iil ee ay dhulkii Masar ka
soo baxeen mooyaane. 11 Oo kolkii wadaaddadii ka soo
baxeen meeshii quduuska ahayd, (waayo, kulli wadaaddadii
joogay oo dhammu way isdaahiriyeen oo milahoodiina ma ay
dhawrin, 12 oo weliba waxaa kaloo joogay kuwii reer Laawi
oo gabayaaga ahaa oo dhan, xataa Aasaaf, iyo Heemaan, iyo
Yeduutuun, iyo wiilashoodii iyo walaalahood, oo waxay soo
xidheen dhar wanaagsan, waxayna wateen suxuun laysku
garaaco, iyo shareerado, iyo kataarado, oo waxay istaageen
meeshii allabariga dhankeedii bari, oo iyaga waxaa la jiray
boqol iyo labaatan wadaad oo turumbooyin ka dhawaajinaya,
) 13 oo haddana markii kuwii turumbada afuufayay iyo kuwii
gabayaaga ahaaba ay luuqdii isla heleen sidii iyagoo ah isku
nin, si ay u sameeyaan cod keliya oo laga maqlo Rabbiga
ammaaniddiisa iyo ku-mahadnaqiddiisa, oo markay codkoodii
kor u qaadeen oo ay ka dhawaajiyeen turumbooyinkii iyo
suxuuntii laysku garaacayay iyo alaabtii muusikada, oo ay
Rabbiga ammaaneen iyagoo leh, Wuu wanaagsan yahay,
waayo, naxariistiisu way raagtaa weligeedba, ayaa daruuri
ka buuxsantay gurigii Rabbiga, 14 oo sidaas daraaddeed
wadaaddadii way taagnaan kari waayeen inay adeegaan
daruurtii aawadeed, waayo, Rabbiga ammaantiisa ayaa ka
buuxsantay gurigii Ilaah.

**6** Markaasaa Sulaymaan hadlay oo yidhi, Rabbiyow,
waxaad sheegtay inaad gudcurka qarada weyn dhex
degganaanayso. 2 Laakiinse waxaan kuu dhisay guri rug kuu
ah oo ah meel aad weligaa degganaanayso. 3 Markaasaa
boqorkii soo jeestay, oo shirkii reer binu Israa'iil oo dhan u
duceeyey, shirkii reer binu Israa'iilna way wada istaageen.
4 Markaasaa Sulaymaan wuxuu yidhi, Mahad waxaa leh
Rabbiga ah Ilaaha reer binu Israa'iil oo afkiisa kula hadlay
aabbahay Daa'uud oo gacmihiisa ku oofiyey isagoo leh, 5
Tan iyo maalintii aan dadkayga ka soo bixiyey dalkii Masar,
qabiilooyinka reer binu Israa'iil oo dhan kama aan dooran
magaalo guri la iiga dhiso si magacaygu halkaas ugu jiro, oo
weliba ninna uma aan dooran inuu ahaado amiir u taliya
dadkayga reer binu Israa'iil. 6 Laakiinse Yeruusaalem baan u
doortay si magacaygu halkaas ugu jiro, oo Daa'uudna baan u
doortay inuu dadkayga reer binu Israa'iil u taliyo. 7 Haddaba
aabbahay Daa'uud waxaa qalbigiisa ku jiray inuu guri u dhiso
magaca Rabbiga ah Ilaaha reer binu Israa'iil. 8 Laakiinse
Rabbigu wuxuu aabbahay Daa'uud ku yidhi, Qalbigaaga
waxaa ku jiray inaad guri u dhisto magacayga aawadiis, oo
taasu hadday qalbigaaga ku jirtay waad ku hagaagsanayd.
9 Habase yeeshee adigu gurigii ii dhisi maysid, laakiinse
wiilkaaga kaa soo bixi doona ayaa magacayga gurigii u dhisi
doona. 10 Haddaba Rabbigu wuu oofiyey eraygiisii uu ku
hadlay, waayo, meeshii aabbahay Daa'uud anigaa fuulay,
oo waxaan ku fadhiistay carshigii reer binu Israa'iil, sidii
Rabbigu ballanqaaday, oo gurigii baan u dhisay Rabbiga ah
Ilaaha reer binu Israa'iil magiciisa. 11 Oo halkaasna waxaan
dhigay sanduuqii uu ku jiray axdigii Rabbiga ee uu reer
binu Israa'iil la dhigtay. 12 Markaasuu hor istaagay meeshii
allabariga ee Rabbiga, iyadoo ay wada joogaan shirkii reer
binu Israa'iil oo dhammu, kolkaasuu gacmihiisii kala bixiyey
13 (waayo, Sulaymaan wuxuu sameeyey mambar naxaas
ah oo dhererkiisu ahaa shan dhudhun, ballaadhkiisuna
shan dhudhun, sarajooggiisuna saddex dhudhun, oo wuxuu
qotomiyey barxadda dhexdeedii, oo intuu ku kor istaagay
ayuu shirkii reer binu Israa'iil oo dhan hortooda ku jilba
joogsaday, oo gacmihiisuu xagga samada u kala bixiyey).
14 Oo wuxuu yidhi, Rabbiyow Ilaaha reer binu Israa'iilow,
samada iyo dhulka toona Ilaah kula mid ahu kuma jiro, adoo
axdiga xajiya oo u naxariista addoommadaada hortaada
ku socda oo kugu aamina qalbigooda oo dhan. 15 Waad
xajisay wixii aad u ballanqaadday aabbahay Daa'uud oo
addoonkaagii ahaa; run ahaan afkaagaad kaga hadashay oo
gacantaadana waad ku oofisay, siday maantadan tahay.
16 Haddaba sidaas daraaddeed, Rabbiyow Ilaaha reer
binu Israa'iilow, xaji wixii aad u ballanqaadday aabbahay
Daa'uud oo addoonkaagii ahaa, adoo ku leh, Hortayda
laga waayi maayo nin kaa dhasho oo carshiga reer binu
Israa'iil ku fadhiista, hadday carruurtaadu isjiraan oo ay
sharcigayga ugu socdaan sidaad hortayda ugu socotay oo
kale. 17 Haddaba sidaas daraaddeed, Rabbiyow Ilaaha
reer binu Israa'iilow, eraygaagii aad addoonkaagii Daa'uud
kula hadashay ha rumoobo. 18 Haddaba ma dhab baa in

Ilaah dadka la degganaan doono dhulka? Xataa samada
iyo samada samooyinku kuma qaadi karaan, haddaba
bal gurigan aan dhisay sidee buu kuu qaadi karaa? 19
Oo weliba Rabbiyow Ilaahayow, aqbal tukashadayda iyo
baryootankayga, anoo addoonkaaga ah, oo maqal qaylada
iyo tukashada anoo addoonkaaga ahu aan hortaada ku
tukanayo, 20 in indhahaagu ay habeen iyo maalinba la jiraan
gurigan oo ah meeshii aad tidhi, Magacayga halkaasaan
dhigi doonaa, si aad u maqashid tukashadayda anoo
addoonkaaga ah oo aan meeshan xaggeeda u soo tukanayo.
21 Bal maqal baryootankayga, anoo addoonkaaga ah,
iyo kan dadkaaga reer binu Israa'iil markaannu meeshan
xaggeeda u soo tukanayno. Kaas ka maqal meeshaad
deggan tahay oo ah samada, oo markaad maqashid na
cafi. 22 Haddii nin deriskiisa ku dembaabo, oo dhaar la
saaro oo la dhaariyo, oo intuu yimaado uu ku hor dhaarto
meeshaada allabariga ee gurigan taal, 23 de markaas
samada ka maqal oo yeel, oo addoommadaada xukun,
adigoo kii shar leh ciqaabaya si aad xumaantii jidkiisa
madaxa ugu saartid, oo aad kii xaq ahna xaq uga dhigtid,
oo aad ugu abaalguddid sida xaqnimadiisu tahay. 24 Oo
haddii dadkaaga reer binu Israa'iil cadowgoodu uu u laayo
dembigii ay kugu dembaabeen aawadiis, oo ay soo noqdaan
oo magacaaga qiraan, oo hortaada ku tukadaan, oo gurigan
kugu baryaan, 25 markaas samada ka maqal, oo dembiga
dadkaaga reer binu Israa'iil ka cafi, oo iyaga ku soo celi
dalkii aad iyaga iyo awowayaashoodba siisay. 26 Oo hadday
kugu dembaabaan, oo aad sidaas daraaddeed samada uga
xidho, oo roob la waayo, oo ay meeshan xaggeeda u soo
tukadaan, oo magacaaga qiraan, oo dembigoodii ka soo
noqdaan markaad dhibtid, 27 de markaas samada ka maqal,
oo dembiga ka cafi addoommadaada iyo dadkaaga reer binu
Israa'iil, markaad bartid jidka wanaagsan ee waajibka ku ah
inay ku socdaan, oo roob u soo dir dalkaaga aad dadkaaga
dhaxal ahaan u siisay. 28 Hadday dalka ka dhacaan abaar,
ama belaayo cudur ah, ama beera-engeeg, ama caariyaysi,
ama ayax, ama diir, ama haddii cadaawayaashoodu ay ku
hareereeyaan dalkooda magaalooyinkiisa, belaayo kasta iyo
cudur kastaba ha ahaadee, 29 kolkaas haddii nin kastaaba
amase dadkaaga reer binu Israa'iil oo dhammu ay tukadaan
oo baryootamaan, oo nin kastaba ogaado belaayadiisa iyo
murugtiisa, oo uu gacmaha u soo fidiyo gurigan xaggiisa,
30 de markaas samada oo ah meeshaad deggan tahay
ka maqal, oo iyaga cafi, oo nin walba ugu abaalgud siday
jidadkiisa oo dhammu yihiin, adoo qalbigiisa og, (maxaa
yeelay, adigoo keliya ayaa garta waxa binu-aadmiga oo dhan
qalbiyadooda ku jira, ) 31 inay kaa cabsadaan oo ay jidkaaga
maraan intay ku nool yihiin dalkii aad awowayaashayo
siisay. 32 Oo weliba shisheeyaha aan dadkaaga reer binu
Israa'iil ahaynna, hadduu dal fog uga yimaado magacaaga
aawadiis, iyo gacantaada xoogga badan aawadeed, iyo
cududdaada fidsan aawadeed, markay yimaadaan oo ay
gurigan xaggiisa u soo tukadaan, 33 de markaas samada
oo ah meeshaad deggan tahay ka maqal, oo shisheeyaha
u yeel wixii uu ku weyddiisto oo dhan, in dadka dunida
jooga oo dhammu ay magacaaga ogaadaan, oo ay kaa
cabsadaan sida dadkaaga reer binu Israa'iil oo kale, iyo
inay ogaadaan in gurigan aan dhisay magacaaga loogu
yeedho. 34 Oo hadday dadkaagu dagaal u baxaan inay
la diriraan cadaawayaashooda oo ay maraan jidkii aad ku
soo dirtay, oo ay ku baryaan oo u soo tukadaan xagga
magaaladan aad doortay iyo xagga gurigii aan magacaaga
u dhisay, 35 de markaas samada ka maqal tukashadooda
iyo baryootankooda, dacwaddoodana u yeel. 36 Haddii ay
kugu dembaabaan, (waayo, nin aan dembaabinu ma jiro, )
oo aad u cadhootid oo aad markaas cadowga u gacangelisid
inay la tagaan oo maxaabiis ahaan ugu kaxaystaan dal
kale, ama ha dhowaado, ama ha dheeraadee, 37 oo
weliba hadday ku fikiraan dalkii maxaabiis ahaanta loogu
kaxaystay, oo ay kuu soo noqdaan, oo ay kugu baryaan
dalkii ay maxaabiista ku yihiin, oo ay yidhaahdaan, Waannu
dembaabnay, oo wax qalloocan baannu samaynay, oo si
shar ah ayaannu u macaamiloonnay, 38 oo hadday kuugu
soo noqdaan qalbigooda oo dhan iyo naftooda oo dhan
intay joogaan dalka ay maxaabiista ku yihiin oo maxaabiis
ahaanta loogu kaxaystay, oo ay u soo tukadaan xagga
dalkoodii aad mar hore awowayaashood siisay, iyo xagga
magaaladii aad doortay, iyo xagga gurigii aan magacaaga
u dhisay, 39 de markaas tukashadooda iyo baryootankooda
ka maqal samada oo ah meeshaad deggan tahay,
dacwaddoodana u yeel, oo cafi dadkaaga kugu dembaabay.
40 Haddaba Ilaahayow waan ku baryayaaye indhahaagu
ha furmeen oo dhegahaaguna ha maqleen baryootanka
meeshan lagu baryootamo. 41 Haddaba sidaas daraaddeed
Rabbiyow, Ilaahow, sara joogso oo gal meeshaada
nasashada, adiga iyo sanduuqa xooggaaguba. Rabbiyow,
Ilaahow, wadaaddadaadu badbaado ha huwaadeen, oo
quduusiintaaduna wanaag ha ku farxeen. 42 Rabbiyow,
Ilaahow, ha iga jeesan anoo ah kan aad subkatay, oo bal
xusuuso raxmaddii aad u samaysay addoonkaagii Daa'uud.

7 Haddaba Sulaymaan markuu tukashadiisii dhammeeyey,
dab baa samada ka yimid oo wada gubay qurbaankii la
gubayay iyo allabaryadiiba, oo gurigana waxaa ka buuxsantay

ammaantii Rabbiga. 2 Oo wadaaddadiina ma ay geli karin
gurigii Rabbiga, maxaa yeelay, gurigii Rabbiga waxaa ka
buuxsantay ammaantii Rabbiga. 3 Oo reer binu Israa'iil
oo dhammuna way wada eegeen markii dabku samada
ka yimid, oo ammaantii Rabbiguna ay guriga kor joogtay,
markaasay wada sujuudeen oo wejigooda dhulka sallaxa
ah saareen, oo Rabbigay caabudeen oo ku mahadnaqeen,
waxayna yidhaahdeen, Isagu wuu wanaagsan yahay, waayo,
naxariistiisu weligeedba way raagtaa. 4 Markaasay boqorkii
iyo dadkii oo dhammuba allabari Rabbiga hortiisa ku bixiyeen.
5 Oo Boqor Sulaymaan wuxuu allabari ahaan u bixiyey
laba iyo labaatan kun oo dibi iyo boqol iyo labaatan kun
oo ido ah. Sidaasay boqorkii iyo dadkii kale oo dhammuba
gooni uga dhigeen gurigii Ilaah. 6 Markaasaa wadaaddadii
waxay u istaageen sidii shuqulkoodu kala ahaa, kuwii reer
Laawina way istaageen iyagoo haysta alaabtii muusikada
ee Rabbiga, taasoo uu Boqor Daa'uud u sameeyey in
Rabbiga lagu mahadnaqo markii Daa'uud Rabbiga ku
ammaanay hawshooda, waayo, naxariistiisu weligeedba
way raagtaa, oo wadaaddadiina hortooday turumbooyin
kaga dhawaajiyeen, oo reer binu Israa'iil oo dhammuna way
wada istaageen. 7 Oo weliba Sulaymaan wuxuu quduus ka
dhigay barxaddii ka horraysay guriga Rabbiga dhexdeeda,
waayo, halkaas wuxuu ku bixiyey qurbaannada la gubo, iyo
baruurtii qurbaannada nabaadiinada, maxaa yeelay, meeshii
allabariga oo naxaasta ahayd ee uu Sulaymaan sameeyey
ma ay wada qaadi karin qurbaanka la gubo iyo qurbaanka
hadhuudhka iyo baruurtaba. 8 Oo wakhtigaas Sulaymaan
sidaasuu iiddii u sameeyey toddoba maalmood, iyadoo ay
la joogaan reer binu Israa'iil oo dhammu, kuwaasoo ahaa
shir aad u weyn, oo waxay ka yimaadeen meesha Xamaad
laga soo galo iyo ilaa durdurka Masar. 9 Oo maalintii
siddeedaadna waxay sameeyeen shir quduus ah, waayo,
iyagu meesha allabariga gooni-ka-dhigiddeedii waxay ku
jireen toddoba maalmood, toddoba maalmoodna waxay ku
jireen iiddii. 10 Oo bishii toddobaad maalinteedii saddex
iyo labaatanaad ayuu dadkii u kala diray teendhooyinkoodii
iyagoo faraxsan oo qalbiga kaga rayraynaya wanaaggii uu
Rabbigu u sameeyey Daa'uud iyo Sulaymaan iyo dadkiisii
reer binu Israa'iilba. 11 Haddaba Sulaymaan sidaasuu u
dhammeeyey gurigii Rabbiga iyo gurigii boqorkaba, oo
wax alla wixii galay Sulaymaan qalbigiisa inuu u sameeyo
gurigii Rabbiga iyo isaga gurigiisiiba dhammaan wuu ku
liibaanay. 12 Oo Rabbiga wuxuu Sulaymaan u muuqday
goor habeennimo ah, oo ku yidhi, Baryadaadii waan maqlay
oo meeshanna waan u doortay inay guri lagu allabaryo ii
ahaato. 13 Haddaba haddaan samada xidho oo roob laga
waayo, ama haddaan ayaxa ku amro inuu dalka cuno, ama
haddaan dadkayga belaayo ku soo dhex daayo, 14 haddii
dadkayga oo ah kuwa magacayga lagu yeedhay ay is-
hoosaysiiyaan, oo i baryaan, oo wejigayga doondoonaan,
oo jidadkoodii xumaa ka soo noqdaan, de markaasaan
samada ka maqli doonaa, oo dembigoodana waan ka cafiyi
doonaa, oo dalkoodana waan bogsiin doonaa. 15 Oo weliba
indhahaygu way furmi doonaan oo dhegahayguna way
maqli doonaan baryootanka meeshan lagu baryootamo.
16 Maxaa yeelay, hadda waxaan gurigan u doortay oo
quduus uga dhigay si magacayga weligiisba halkaas loogu
daayo, oo indhahayga iyo qalbigayguba halkaasay joogi
doonaan weligood iyo weligoodba. 17 Oo adiguna haddaad
sidii aabbahaa Daa'uud oo kale hortayda ugu socotid, si
aad u yeeshid wax alla wixii aan kugu amray oo dhan,
oo aad u xajisid qaynuunnadayda iyo xukummadayda, 18
markaasaan dhisi doonaa carshiga boqortooyadaada, sidaan
axdi kula dhigtay aabbahaa Daa'uud markaan ku idhi, Lagaa
waayi maayo nin reer binu Israa'iil u taliya. 19 Laakiinse
haddaad iga leexataan oo aad ka tagtaan qaynuunnadayda
iyo amarradayda aan idin hor dhigay, oo aad intaad tagtaan
ilaahyo kale u adeegtaan oo caabuddaan, 20 de markaasaan
xididdadooda ka rujin doonaa dalkayga aan iyaga siiyey,
oo gurigan aan magacayga aawadiis quduus uga dhigayna
hortaydaan ka tuuri doonaa, oo waxaan isaga dadyowga
oo dhan kaga dhex dhigi doonaa maahmaah iyo halqabsi.
21 Oo gurigan aad u dheerna ku alla kii soo ag maraaba
wuu la yaabi doonaa, oo wuxuu odhan doonaa, Rabbigu
muxuu sidan uga dhigay dalkan iyo gurigan? 22 Oo waxaa
lagu jawaabi doonaa, Waxay ka tageen Rabbigii ahaa Ilaaha
awowayaashood oo iyaga ka soo bixiyey dalkii Masar,
oo waxay raaceen ilaahyo kale, wayna caabudeen oo u
adeegeen, oo sidaas daraaddeed ayuu xumaantan oo dhan
ugu soo dejiyey.

8 Oo markay dhammaadeen labaatankii sannadood ee
uu Sulaymaan guriga Rabbiga iyo gurigiisiiba dhisayay,
2 ayuu Sulaymaan dhisay magaalooyinkii Xuuraam isaga
siiyey, oo wuxuu halkaas dejiyey reer binu Israa'iil. 3 Oo
haddana Sulaymaan wuxuu tegey Xamad Soobaah, wuuna
ka adkaaday. 4 Oo cidladiina ayuu Tadmor ka dhisay, oo
weliba wuxuu Xamaad ka dhisay magaalooyinkii wax lagu
kaydin jiray oo dhan. 5 Oo weliba wuxuu kaloo dhisay
Beytxooroontii sare iyo Beytxooroontii hooseba, wuxuuna ka
dhigay magaalooyin deyr leh oo ay derbiyo ku wareegsan
yihiin oo irdo iyo qataarroba leh, 6 iyo weliba Bacalad, iyo
magaalooyinkii wax lagu kaydin jiray oo uu Sulaymaan lahaa

oo dhan, iyo magaalooyinkii gaadhifardoodkiisa oo dhan,
iyo magaalooyinkii fardooleydiisa, iyo wixii uu Sulaymaan
jeclaaday inuu ka dhisto Yeruusaalem, iyo Lubnaan, iyo dalkii
uu boqorka ka ahaa oo dhan. 7 Oo weliba dadkii ka hadhay
reer Xeed, iyo reer Amor, iyo reer Feris, iyo reer Xiwi, iyo reer
Yebuus oo aan reer binu Israa'iil ahayn, 8 kuwaas farcankoodii
dalka ku hadhay, oo aanay reer binu Israa'iil baabbi'in,
Sulaymaan wuxuu ka dhigtay addoommo ilaa maantadan la
joogo. 9 Laakiinse reer binu Israa'iil Sulaymaan shuqulkiisii
addoommo ugama uu dhigan, waxayse ahaayeen rag
dagaalyahan ah iyo madaxdii saraakiishiisa, iyo taliyayaashii
gaadhifardoodkiisa iyo fardooleydiisaba. 10 Oo kuwanu
waxay ahaayeen saraakiishii Boqor Sulaymaan oo ahaa
laba boqol iyo konton nin oo dadka u taliya. 11 Markaasaa
Sulaymaan gabadhii Fircoon ka soo kaxeeyey magaaladii
Daa'uud oo wuxuu keenay gurigii uu iyada u dhisay, waayo,
wuxuu yidhi, Naagtaydu degganaan mayso gurigii Daa'uud
oo ahaa boqorkii reer binu Israa'iil, maxaa yeelay, meelihii
sanduuqa Rabbigu yimid waa wada quduus. 12 Oo haddana
Sulaymaan wuxuu Rabbiga qurbaanno la gubo ugu bixiyey
meeshii allabariga ee Rabbiga oo uu isagu ka dhisay
balbalada horteedii. 13 Wuxuu bixiyey wixii Muuse amray
in la bixiyo maalin kasta, iyo Sabtiyada, iyo markay bilaha
cusubu dhashaan, iyo iidaha sannaddiiba saddex jeer loo
amray, kuwaasoo ahaa Iiddii Kibista-aan-khamiirka-lahayn,
iyo Iiddii Toddobaadyada, iyo Iiddii Taambuugyada. 14
Oo kooxihii wadaaddadu ku adeegi jireen iyo kuwii reer
Laawi shuqulkooda loo amray ku samayn jireenba wuxuu
ka dhigay si waafaqsan amarkii aabbihiis Daa'uud inay
Rabbiga ammaanaan oo ay wadaaddada hortooda ka
adeegaan sidii maalin kasta hawsheedii loo doonayay,
oo weliba iridjoogayaashii ayuu kooxahoodii irid kasta ku
taagay, waayo, sidaas waxaa amray Daa'uud oo ahaa ninkii
Ilaah. 15 Oo iyana kama ay tegin amarkii boqorku ku amray
wadaaddada iyo reer Laawi oo ku saabsanaa xaal kasta iyo
xaggii khasnadahaba. 16 Haddaba Sulaymaan shuqulkiisa
oo dhammu diyaar buu u ahaa maalintii guriga Rabbiga
aasaaskiisa la dhigay iyo ilaa maalintii la dhammeeyey.
Oo sidaasaa guriga Rabbiga loo ebyey. 17 Markaasaa
Sulaymaan wuxuu tegey xagga Cesyoon Geber iyo Eelood
oo ku yaal xeebta badda ee dalka Edom. 18 Oo Xuuraamna
wuxuu gacanta addoommadiisii ugu sii dhiibay doonniyo iyo
addoommo badda aqoon u leh, oo iyagu waxay addoommadii
Sulaymaan u soo raaceen Oofir, oo halkaasayna Boqor
Sulaymaan uga keeneen afar boqol iyo konton talanti oo
dahab ah.

9 Boqoraddii Shebaa markay maqashay Sulaymaan warkiisii
ayay Sulaymaan ugu timid Yeruusaalem inay ku imtixaanto
su'aalo adadag, oo waxay wadatay dad aad u badan, iyo
awr badan oo ay ku raran yihiin uunsi, iyo dahab aad u
badan, iyo dhagaxyo qaali ah; oo markay Sulaymaan u timid
wixii qalbigeeda ku jiray oo dhan ayay kala hadashay. 2
Sulaymaanna wuxuu uga jawaabay su'aalaheedii oo dhan,
oo wax Sulaymaan ka qarsoonaa oo uusan u sheegin ma
jirin. 3 Boqoraddii Shebaana markay aragtay xigmaddii
Sulaymaan iyo gurigii uu dhisay, 4 iyo cuntadii miiskiisa, iyo
fadhigii addoommadiisa, iyo hawshii adeegayaashiisa iyo
dharkoodii, iyo kuwiisii cabniinka siin jiray iyo dharkoodii,
iyo wixii uu guriga Rabbiga ku fuuli jiray, naf dambe iyadii
kuma hadhin. 5 Markaasay boqorkii ku tidhi, Warkii aan
dalkaygii ku maqlay ee ku saabsanaa falimahaaga iyo
xigmaddaada run buu ahaa. 6 Habase yeeshee erayadoodii
ma aan rumaysan jeeraan imid oo ay indhahaygu arkeen, oo
weliba xigmaddaada weynaanteedii badhna la iima sheegin,
haddaba waad ka sii weyn tahay warkii aan maqlay. 7 Waxaa
faraxsan raggaaga oo waxaa faraxsan addoommadaadan
had iyo goorba hortaada taagan oo xigmaddaadana maqla.
8 Waxaa mahad leh Rabbiga Ilaahaaga ah oo kugu farxay
inuu kugu fadhiisiyo carshigiisa inaad boqor ahaatid Rabbiga
Ilaahaaga ah aawadiis. Ilaahaagu wuu jeclaaday reer binu
Israa'iil inuu xoogeeyo weligood, oo sidaas aawadeed
ayuu kaaga dhigay boqor iyaga u taliya inaad samaysid
xukun iyo caddaalad. 9 Markaasay boqorkii siisay boqol
iyo labaatan talanti oo dahab ah, iyo uunsi faro badan,
iyo dhagaxyo qaali ah; oo boqoraddii Shebaa uunsigii ay
Boqor Sulaymaan siisay oo kale ma jirin. 10 Oo Xuuraam
addoommadiisii iyo Sulaymaan addoommadiisii oo Oofir
dahab ka keenay, waxay kaloo keeneen geedo almuug ah
iyo dhagaxyo qaali ah. 11 Oo boqorkiina geedihii almuugga
ahaa ayuu gurigii Rabbiga iyo gurigii boqorkaba uga dhigay
jaranjarooyin, oo wuxuu kaloo nimankii gabayaaga ahaa
uga sameeyey kataarado iyo shareerado, oo waxaasoo
kalena hore looguma arag dalka Yahuudah. 12 Oo Boqor
Sulaymaanna wuxuu boqoraddii Shebaa siiyey wax alla
wixii ay doonaysay oo dhan oo ay weyddiisatay, iyo weliba
wax ka sii badan wixii ay boqorka u keentay. Markaasay
noqotay oo dalkeedii tagtay iyada iyo addoommadeediiba.
13 Haddaba dahabkii sannad kasta Sulaymaan u iman jiray
miisaankiisu wuxuu ahaa lix boqol iyo lix iyo lixdan talanti
oo dahab ah, 14 oo intaasu kuma jirin wixii ay keeni jireen
geddisleyda iyo baayacmushtariyaashu, oo boqorradii dalka
Carabta iyo taliyayaashii waddanka oo dhammuna waxay
Sulaymaan u keeni jireen dahab iyo lacag. 15 Markaasaa

Boqor Sulaymaan wuxuu sameeyey laba boqol oo gaashaan
oo waaweyn oo dahab la tumay ah, oo gaashaan weynba
waxaa galay lix boqol oo sheqel oo dahab la tumay ah. 16 Oo
haddana wuxuu kaloo sameeyey saddex boqol oo gaashaan
oo yaryar oo dahab la tumay ah, oo gaashaan yarba waxaa
galay saddex boqol oo sheqel oo dahab ah; markaasaa
boqorku iyagii dhigay gurigii ku yiil kaynta Lubnaan. 17 Oo
weliba boqorku wuxuu kaloo sameeyey carshi weyn oo
foolmaroodi ah, oo wuxuu ku dahaadhay dahab saafi ah. 18
Carshigu wuxuu lahaa jaranjaro lix tallaabo ah; oo waxaa la
jiray cagodhig dahab ah oo carshiga ku xidhan, oo kursiga
meeshii lagu fadhiisto labadeeda dhinacba waxay lahayd
meelo xusullada la saarto, oo meelaha xusullada la saartana
dhinacooda waxaa taagnaa laba libaax. 19 Oo jaranjaradii
lixdeedii tallaabo labadooda dhinac waxaa ka taagnaa laba
iyo toban libaax, oo boqortooyona saas oo kale looguma
samayn. 20 Oo Boqor Sulaymaan weelashiisii wax lagu
cabbi jiray oo dhammu waxay wada ahaayeen dahab, gurigii
kaynta Lubnaan weelashiisii oo dhammuna waxay wada
ahaayeen dahab saafi ah; wakhtigii Sulaymaan lacag waxba
qiimo ma lahayn. 21 Maxaa yeelay, boqorku wuxuu lahaa
doonniyo Tarshiish u dhoofa oo waxay raaceen addoommadii
Xuuraam, oo saddexdii sannadoodba mar bay doonniyihii
Tarshiish iman jireen, oo waxay keeni jireen dahab, iyo lacag,
iyo foolmaroodi, iyo daayeerro, iyo daa'uusyo. 22 Sidaasuu
Boqor Sulaymaan xagga maalka iyo xagga xigmaddaba
ugaga hor maray boqorradii dunida oo dhan. 23 Oo boqorradii
dunida oo dhammuna waxay doondooneen Sulaymaan inay
arkaan oo ay maqlaan xigmaddii Ilaah qalbigiisa geliyey. 24
Oo nin waluba wuxuu sannad kasta u keeni jiray hadiyaddiis
oo ay ka mid yihiin weelal lacag ah, iyo weelal dahab
ah, iyo dhar, iyo hub, iyo uunsi, iyo fardo, iyo baqlo. 25
Sulaymaanna wuxuu lahaa afar kun oo xero oo fardaha iyo
gaadhifardoodka lagu xereeyo, iyo laba iyo toban kun oo
nin oo fardooley ah, oo wuxuu fadhiisiyey magaalooyinkii
gaadhifardoodka, oo qaarna boqorkay Yeruusaalem la
joogeen. 26 Oo wuxuu u wada talin jiray kulli boqorradii
joogay Webiga ilaa dalka reer Falastiin iyo ilaa soohdinta
Masar. 27 Oo boqorku wuxuu lacag Yeruusaalem kaga
dhigay sida dhagaxyo oo kale, oo geedo kedar ahna wuxuu
u soo badiyey oo ka dhigay sida geedaha darayga ah oo
dhulka hoose ka baxa oo kale. 28 Oo Sulaymaanna fardo
waxaa looga keeni jiray Masar iyo dalalka kale oo dhanba.
29 Haddaba Sulaymaan falimihiisii kale intii hore iyo intii
dambeba sow kuma qorna taariikhdii Nebi Naataan, iyo wax
sii sheegiddii Axiiyaah kii reer Shiiloh, iyo waxyaalihii la tusay
Iddo oo wax arke ahaa oo ku saabsanaa Yaaraabcaam
ina Nebaad? 30 Oo Sulaymaan afartan sannadood ayuu
reer binu Israa'iil oo dhan Yeruusaalem boqor ugu ahaa. 31
Sulaymaanna wuu dhintay oo la seexday awowayaashiis
oo waxaa lagu aasay magaaladii aabbihiis Daa'uud, oo
meeshiisiina waxaa boqor ka noqday wiilkiisii Rexabcaam.

10 Markaasaa Rexabcaam wuxuu tegey Shekem, maxaa
yeelay, reer binu Israa'iil oo dhammu waxay yimaadeen
Shekem inay isaga ku soo boqraan. 2 Oo markii Yaaraabcaam
ina Nebaad taas maqlay ayuu ka soo noqday dalkii Masar
(waayo, wuxuu joogay dalkii Masar oo uu Boqor Sulaymaan
kaga cararay). 3 Waa loo cid diray oo loo yeedhay, oo
Yaaraabcaam iyo reer binu Israa'iil oo dhammuna way
yimaadeen, markaasay Rexabcaam la hadleen, oo waxay
ku yidhaahdeen, 4 War aabbahaa harqood daran buu
na saaray, haddaba noo fududee hawshii aabbahaa oo
adkayd iyo harqoodkiisii cuslaa oo uu na saaray, annana
waannu kuu adeegaynaa. 5 Markaasuu ku yidhi, Saddex
maalmood dabadood igu soo noqda. Markaasaa dadkii
ka tegey. 6 Markaasaa Boqor Rexabcaam la tashaday
odayaashii aabbihiis Sulaymaan intuu noolaa hor joogi jiray,
oo wuxuu ku yidhi, War maxaad igula talinaysaan oo aan
dadkan jawaab ugu celiyaa? 7 Oo intay la hadleen ayay
ku yidhaahdeen, Haddaad dadkan u roonaatid, oo aad ka
farxisid, oo aad erayo wanaagsan kula hadashid, markaasay
weligood addoommo kuu ahaanayaan. 8 Laakiinse wuu ka
tegey taladii odayaashu kula taliyeen, oo haddana wuxuu la
arrinsaday raggii dhallinyarada ahaa oo isaga la koray ee
hortiisa joogay. 9 Oo wuxuu iyagii ku yidhi, War maxaad
igula talinaysaan oo aan jawaab ugu celinnaa dadkan ila
hadlay oo igu yidhi, War harqoodkii aabbahaa na saaray noo
fududee? 10 Markaasay raggii dhallintayaraa oo isaga la
koray la hadleen, oo waxay ku yidhaahdeen, La hadal dadkii
kula hadlay oo kugu yidhi, Aabbahaa harqood daran buu na
saaray ee adigu noo fududee. Oo waxaad ku tidhaahdaa,
Faryaradaydu waa ka sii dhumuc weyn tahay aabbahay
dhexdiisa. 11 Haddaba meeshii aabbahay harqood culus
idinka saaray, anna culays baan idiinku sii darayaa, oo
aabbahay wuxuu idinku edbin jiray shaabuugyo, laakiinse
anigu waxaan idinku edbinayaa hangarallayaal. 12 Sidaas
daraaddeed Yaaraabcaam iyo dadkii oo dhammuba maalintii
saddexaad ayay Rexabcaam u yimaadeen siduu boqorku
hore ugu amray markuu ku yidhi, Maalinta saddexaad igu
soo noqda. 13 Markaasaa Boqor Rexabcaam ka tegey taladii
raggii odayaasha ahaa, oo si qallafsan ayuu ugu jawaabay,
14 oo wuxuu kula hadlay taladii raggii dhallintayaraa, oo ku
yidhi, Aabbahay harqood culus buu idin saaray, laakiinse

anna culays kalaan idiinku sii darayaa, aabbahay wuxuu idinku edbin jiray shaabuugyo, laakiinse anigu waxaan idinku edbinayaa hangarallayaal. 15 Sidaas daraaddeed boqorkii dadkii ma uu dhegaysan, waayo, taasu xagga Ilaah bay ka timid, si uu Rabbigu u adkeeyo eraygiisii uu Yaaraabcaam ina Nebaad kula hadlay oo uu u soo dhiibay Axiiyaah kii reer Shiiloh. 16 Oo dadkii Israa'iil oo dhammuna markay arkeen inaan boqorku dhegaysan ayaa dadkii waxay boqorkii ugu jawaabeen oo ku yidhaahdeen, Bal maxaan qayb ku leennahay Daa'uud? Dhaxalna kuma lihin ina Yesay. Haddaba dadkii Israa'iilow, nin kastow, teendhadaadii tag. Oo Daa'uudow, bal eeg, reerkaagii waa kuu kaas. Markaasay dadkii Israa'iil oo dhammu teendhooyinkoodii tageen. 17 Laakiinse Rexabcaam wuxuu boqor u ahaa intii reer binu Israa'iil ahayd ee degganayd magaalooyinka reer Yahuudah. 18 Markaasaa Boqor Rexabcaam wuxuu diray Hadooraam oo cashuurta u sarreeyey, oo dadkii Israa'iil dhagax bay la dhaceen, wuuna dhintay. Markaasaa Boqor Rexabcaam ku degdegay inuu fuulo gaadhifaraskiisii si uu Yeruusaalem ugu cararo. 19 Sidaasay dadkii Israa'iil ugu caasiyoobeen Daa'uud reerkiisii ilaa maantadan la joogo.

**11** Oo Rexabcaam markuu Yeruusaalem tegey wuxuu reer Yahuudah iyo reer Benyaamiin ka soo shiriyey boqol iyo siddeetan kun oo rag la doortay oo dagaalyahan ahaa si ay dadkii Israa'iil ula diriraan oo ay boqortooyadii mar kale ugu soo celiyaan Rexabcaam. 2 Laakiinse Shemacyaah oo nin Ilaah ahaa waxaa u yimid eraygii Ilaah oo leh, 3 La hadal Rexabcaam ina Sulaymaan oo reer Yahuudah boqor u ah, iyo reer binu Israa'iilka dalka reer Yahuudah iyo kan reer Benyaamiin deggan oo dhan, oo waxaad ku tidhaahdaa, 4 Rabbigu wuxuu leeyahay, Waa inaydnaan kor u bixin oo aydnaan walaalihiin la diririn. Nin waluba gurigiisii ha ku noqdo, waayo, waxanu aniguu iga yimid. Sidaas aawadeed way maqleen Eraygii Rabbiga, wayna ka noqdeen Yaaraabcaam kii ay ku kaceen. 5 Oo Rexabcaamna wuxuu iska degganaa Yeruusaalem oo dalka Yahuudah ayuu magaalooyin qalcado leh ka dhisay. 6 Oo kuwuu dhisay waxay ahaayeen Beytlaxam, iyo Ceetaam, iyo Teqooca, 7 iyo Beytsuur, iyo Sookoo, iyo Cadullaam, 8 iyo Gad, iyo Maareeshaah, iyo Siif, 9 iyo Adoorayim, iyo Laakiish, iyo Caseeqaah, 10 iyo Sorcaah, iyo Ayaaloon, iyo Xebroon, oo dhammaantood ku yaal dalka reer Yahuudah iyo kan reer Benyaamiin, waxayna wada ahaayeen magaalooyin deyr leh. 11 Oo isagu qalcadihii ayuu xoogeeyey oo wuxuu halkaas fadhiisiyey saraakiil, wuxuuna ku kaydiyey cunto iyo saliid iyo khamri. 12 Oo magaalo kasta wuxuu dhigay gaashaammo iyo warmo, kulligoodna aad buu u xoogeeyey. Oo dalka Yahuudah iyo dalka Benyaamiinna isagaa iska lahaa. 13 Oo wadaaddadii iyo kuwii reer Laawi oo reer binu Israa'iil dhex joogay oo dhammuna isagay uga yimaadeen meelahoodii oo dhan. 14 Waayo, reer Laawi way ka soo kaceen degmooyinkoodii iyo hantidoodiiba oo waxay yimaadeen dalkii Yahuudah iyo Yeruusaalem, waayo, Yaaraabcaam iyo wiilashiisii ayaa iyaga eryay si ayan Rabbiga ugu samayn shuqulkii wadaadnimada. 15 Oo isagu wuxuu wadaaddo u doortay meelihii sarsare iyo orgiyadii iyo weylihii uu isagii sameeyey. 16 Oo dabadoodna qabiilooyinka reer binu Israa'iil oo dhan in alla intii qalbigooda ku qabata inay doondoonaan Rabbiga ah Ilaaha reer binu Israa'iil waxay iman jireen Yeruusaalem inay allabari u bixiyaan Rabbiga ah Ilaaha awowayaashood. 17 Markaasay xoogeeyeen boqortooyadii dalka Yahuudah, oo intii saddex sannadood ah ayay xoogeeyeen Rexabcaam ina Sulaymaan, waayo, saddex sannadood ayay ku socdeen jidkii Daa'uud iyo kii Sulaymaanba. 18 Oo Rexabcaam wuxuu guursaday Maxalad oo ay dhaleen Yeriimood ina Daa'uud iyo Abiixayil oo ahayd ina Elii'aab ina Yesay, 19 oo iyana waxay isagii u dhashay wiilal, waana Yecuush, iyo Shemaryaah, iyo Saham. 20 Oo iyada dabadeedna wuxuu guursaday Macakaah oo ahayd ina Absaaloom, oo waxay isagii u dhashay Abiiyaah, iyo Catay, iyo Siisaa, iyo Shelomiid. 21 Oo Rexabcaamna wuxuu naagihiisii iyo addoommihiisaba ka sii jeclaaday Macakaah oo ahayd ina Absaaloom, (waayo, wuxuu guursaday siddeed iyo toban naagood iyo lixdan addoommo ah, oo wuxuuna dhalay siddeed iyo labaatan wiil iyo lixdan gabdhood.) 22 Oo Rexabcaamna wuxuu madax ka dhigay Abiiyaah oo ay dhashay Macakaah, kaasoo walaalihiis amiir ka dhex ahaa, waayo, wuxuu damacsanaa inuu isaga boqor ka dhigo. 23 Oo wuxuu u macaamilooday si caqli ah, oo wiilashiisii oo dhanna wuu ku kala firdhiyey magaalooyinkii deyrka lahaa ee dalkii reer Yahuudah iyo kii reer Benyaamiin oo dhan, oo iyagii wuxuu siiyey cunto badan. Wuxuuna u doondoonay naago badan.

**12** Markii boqortooyadii Rexabcaam ay dhisantay oo uu xoogaystay ayuu ka tegey sharcigii Rabbiga, iyadoo ay reer binu Israa'iil oo dhammuba la jiraan. 2 Oo sannaddii shanaad oo Boqor Rexabcaam ayaa Shiishaq oo boqorkii Masar ahaa Yeruusaalem ku kacay, maxaa yeelay, iyagu waxay ku xadgudbeen Rabbiga, 3 oo wuxuu kaxaystay kun iyo laba boqol oo gaadhifaras iyo lixdan kun oo fardooley ah, oo dadkii isaga Masar kala soo baxayna tiro ma ay lahayn, waxayna ahaayeen reer Luubiim iyo reer Sukiyiim iyo reer Itoobiya. 4 Oo isagu wuxuu

qabsaday magaalooyinkii deyrka lahaa ee dalka Yahuudah,
oo haddana wuxuu yimid Yeruusaalem. 5 Haddaba Nebi
Shemacyaah ayaa u yimid Rexabcaam iyo amiirradii
dalka Yahuudah oo Yeruusaalem ugu urursanaa Shiishaq
daraaddiis, oo wuxuu iyagii ku yidhi, Rabbigu wuxuu leeyahay,
Idinku waad i dayriseen oo sidaas daraaddeed ayaan
gacanta Shiishaq idinkaga tegey. 6 Markaasaa amiirradii
dadka Israa'iil iyo boqorkiiba is-hoosaysiiyeen, oo waxay
yidhaahdeen, Rabbigu waa xaq. 7 Oo Rabbiguna markuu
arkay inay is-hoosaysiiyeen ayaa eraygii Rabbigu u yimid
Shemacyaah, wuxuuna ku yidhi, Iyagu way is-hoosaysiiyeen
oo taas aawadeed anigu baabbi'in maayo, laakiinse waan
samatabbixin doonaa, oo cadhadayduna Yeruusaalem kuma
degi doonto iyadoo gacanta Shiishaq ku timid. 8 Habase
ahaatee waxay ahaan doonaan addoommadiisa, si ay u
ogaadaan adeegiddayda iyo adeegidda boqortooyooyinka
waddammadaba. 9 Haddaba sidaas daraaddeed Shiishaq
oo ahaa boqorkii Masar wuxuu ku kacay Yeruusaalem oo
wuxuu qaatay khasnadihii guriga Rabbiga iyo khasnadihii
guriga boqorkaba, oo dhammaantood wuu wada qaatay,
oo wuxuu kaloo wada qaatay gaashaammadii dahabka
ahaa oo Sulaymaan sameeyey. 10 Oo Boqor Rexabcaam
ayaa meeshoodii ka sameeyey gaashaammo naxaas ah,
oo wuxuu u dhiibay saraakiishii waardiyayaashii albaabka
guriga boqorka dhawri jiray. 11 Oo mar alla markuu boqorku
gurigii Rabbiga galo ayay waardiyayaashu iman jireen oo
ay gaashaammada soo qaadi jireen, oo haddana waxay
ku soo celin jireen qolkii waardiyayaasha. 12 Oo markuu
isagu is-hoosaysiiyey ayaa cadhadii Rabbigu ka noqotay si
aan Rabbigu isaga dhammaantiisba u baabbi'in, oo weliba
dalka Yahuudah waxyaalo wanwanaagsan baa laga heli
jiray. 13 Haddaba Boqor Rexabcaam wuxuu ku xoogaystay
Yeruusaalem oo xukumay, oo Rexabcaam markuu boqor
noqday wuxuu jiray kow iyo afartan sannadood, oo toddoba
iyo toban sannadood ayuu boqor ku ahaa Yeruusaalem oo
ahayd magaaladii Rabbigu ka doortay qabiilooyinka reer binu
Israa'iil oo dhan inuu magiciisa halkaas dhigo; oo hooyadiis
magaceedu wuxuu ahaa Nacamaah tii reer Cammoon. 14
Oo isagu wuxuu sameeyey wax shar ah, maxaa yeelay,
qalbigiisa uma uu diyaarin inuu Rabbiga doondoono. 15
Haddaba Rexabcaam falimihiisii, intii hore iyo intii dambeba,
sow kuma qorna taariikhdii Nebi Shemacyaah iyo tii Iddo
oo ahaa waxarkihii, siday ahaayeen abtirsiinyadii? Oo had
iyo goorna dagaal baa ka dhaxayn jiray Rexabcaam iyo
Yaaraabcaam. 16 Oo Rexabcaamna wuu dhintay oo la
seexday awowayaashiis, oo waxaa lagu aasay magaaladii
Daa'uud, oo meeshiisiina waxaa boqor ka noqday wiilkiisii
Abiiyaah.

13 Haddaba sannaddii siddeed iyo tobnaad ee Boqor
Yaaraabcaam ayaa Abiiyaah boqor ka noqday dalka
Yahuudah. 2 Oo saddex sannadood ayuu boqor ku ahaa
Yeruusaalem, oo hooyadiis magaceedana waxaa la odhan
jiray Miikaayaah ina Uurii'eel oo reer Gibecaah ah. Oo
Abiiyaah iyo Yaaraabcaamna dagaal baa ka dhexayn jiray.
3 Oo Abiiyaah dagaal buu u baxay isagoo wata ciidan
dagaalyahan ah oo xoog badan, oo waxayna ahaayeen
afar boqol oo kun oo ah rag la xushay; oo Yaaraabcaamna
wuxuu dagaal isaga ka gees ah u diyaariyey siddeed boqol
oo kun oo nin oo ah rag la xushay oo dhammaantoodna
rag xoog badan ah. 4 Markaasaa Abiiyaah wuxuu kor
fuulay Buur Semaarayim oo ku taal dalka buuraha leh
oo reer Efrayim, oo wuxuu yidhi, Yaaraabcaam iyo dadkii
Israa'iil dhammaantiin i maqla. 5 War, miyeydnaan ogayn
in Rabbiga Ilaaha reer binu Israa'iil ahu Daa'uud weligiis
siiyey boqortooyada reer binu Israa'iil u talisa oo wuxuu
isaga iyo wiilashiisana ku siiyey axdi cusbo leh? 6 Laakiin
Yaaraabcaam ina Nebaad oo ahaa addoonkii Sulaymaan ina
Daa'uud ayaa kacay oo ka fallaagoobay sayidkiisii. 7 Oo
waxaa isagii u soo shiray rag xunxun oo waxmatarayaal ah,
wayna xoogaysteen iyagoo ka gees ah Rexabcaam oo ahaa
ina Sulaymaan, oo taasuna waxay ahayd intii Rexabcaam
uu dhallintayaraa oo uu qalbigiisu nuglaa, oo uusan iyaga
hor joogsan karin. 8 Oo hadda idinku waxaad ku fikiraysaan
inaad boqortooyada Rabbiga ka hor joogsataan gacanta ilma
Daa'uud, oo weliba idinku waxaad tihiin dad faro badan, oo
waxaadna wadataan weylihii dahabka ahaa oo Yaaraabcaam
idiinku sameeyey Ilaah ahaan. 9 Oo weliba idinku sow ma
aydaan eryin wadaaddadii Rabbiga oo ilma Haaruun ahaa
iyo kuwii reer Laawiba? Oo wadaaddo sow uma aydaan
samaysan sidii ay ahaan jirtay caadadii dadyowga dalalka
kale deggan? Oo sidaas daraaddeed ku alla kii u yimaadaa
inuu quduus iska dhigo isagoo wata dibi yar iyo toddoba
wan, kaasu wuxuu wadaad u noqon karaa waxyaalo aan
ilaahyo ahayn. 10 Laakiinse Rabbigu waa Ilaahayaga, oo
kama aannu tegin, oo waxaannu haysannaa wadaaddo
Rabbiga u adeega, kuwaasoo ah ilma Haaruun, iyo kuwii
reer Laawi oo shuqulkoodii ku jira. 11 Oo iyagu subax kasta
iyo fiid kasta waxay Rabbiga u gubaan qurbaan la gubo iyo
foox udgoon, oo kibistii tusniintana waxay ku hagaajiyaan
miiska daahirka ah korkiisa, oo laambadda dahabka ah iyo
laambadaheedii waxay shidaan fiid kasta, waayo, annagu
waan xajinnaa amarkii Rabbiga Ilaahaya ah, laakiinse idinku

waad ka tagteen. 12 Oo bal eega waxaa nala jira Ilaah isagoo
madax noo ah, iyo wadaaddadiisii oo wata turumbooyinkii
lagu dhawaajiya, oo waxay idinku afuufi doonaan dhawaaq,
haddaba dadka Israa'iilow, ha la diririna Rabbiga ah Ilaaha
awowayaashiin, waayo, liibaani maysaan. 13 Laakiinse
Yaaraabcaam wuxuu iyaga gadaal ka dhigay ciidan gaadmo
ah, haddaba iyagu waxay hor joogeen dadkii Yahuudah oo
ciidankii gaadmada ahaana wuxuu joogay gadaashooda.
14 Oo dadkii Yahuudah markay gadaashooda eegeen
waxay arkeen in hore iyo gadaalba laga soo weeraray,
markaasay Rabbiga u qayshadeen, oo wadaaddadiina
waxay ka dhawaajiyeen turumbooyinkii. 15 Markaasay dadkii
Yahuudah qayliyeen oo markay dadkii Yahuudah qayliyeen
ayaa Rabbigu wax ku dhuftay Yaaraabcaam iyo dadkii
Israa'iil oo dhan Abiiyaah iyo dadkii Yahuudah hortooda.
16 Markaasaa dadkii Israa'iil ka carareen dadkii Yahuudah
hortooda, oo Rabbiguna wuxuu ku riday gacantoodii. 17 Oo
Abiiyaah iyo dadkiisiina aad bay u laayeen, oo waxaa dadkii
Israa'iil ka le'day shan boqol oo kun oo ah rag la xushay. 18
Haddaba dadkii Israa'iil sidaasaa wakhtigaas loo jebiyey oo
waxaa ka adkaaday dadkii Yahuudah, maxaa yeelay, iyagu
waxay isku halleeyeen Rabbiga ah Ilaaha awowayaashood.
19 Oo Abiiyaah baa eryaday Yaaraabcaam oo wuxuu ka
qabsaday magaalooyin badan kuwaasoo ahaa Beytel iyo
tuulooyinkeedii, iyo Yeshaanaah iyo tuulooyinkeedii, iyo
Cefroon iyo tuulooyinkeedii. 20 Oo Yaaraabcaamna xoog
dambe ma uu helin wakhtigii Abiiyaah noolaa, oo Rabbiga
ayaa wax ku riday, wuuna dhintay. 21 Laakiinse Abiiyaah
wuu sii xoogaystay, oo wuxuu guursaday afar iyo toban
naagood, oo wuxuuna dhalay laba iyo labaatan wiil iyo lix iyo
toban gabdhood. 22 Haddaba Abiiyaah falimihiisii kale, iyo
socodkiisii, iyo hadalladiisiiba waxay ku qoran yihiin kitaabkii
Nebi Iddo.

**14** Markaasaa Abiiyaah dhintay oo la seexday
awowayaashiis, oo waxaa lagu aasay magaaladii
Daa'uud, oo meeshiisiina waxaa boqor ka noqday wiilkiisii
Aasaa, oo wakhtigiisiina dalku wuu xasilloonaa intii toban
sannadood ah. 2 Oo Aasaana wuxuu sameeyey wixii
Rabbiga Ilaahiisa ah hortiisa ku wanaagsanaa oo ku
qummanaa, 3 maxaa yeelay, isagu wuxuu baabbi'iyey
meelihii allabariga ee qalaadaa iyo meelihii sarsare, oo
tiirarkiina wuu wada jejebiyey, geedihii Asheeraahna wuu
wada jaray, 4 oo dadkii Yahuudahna wuxuu ku amray inay
doondoonaan Rabbiga ah Ilaaha awowayaashood, iyo inay
yeelaan sharciga iyo amarka. 5 Oo haddana magaalooyinkii
dalka Yahuudah oo dhan wuxuu ka baabbi'iyey meelihii
sarsare iyo sanamyadii qorraxda, oo boqortooyaduna isaga
hortiisa way ku xasilloonayd. 6 Oo isagu dalka Yahuudahna
wuxuu ka dhisay magaalooyin deyr leh, maxaa yeelay, dalku
wuu xasilloonaa oo isaguna dagaal ma gelin sannadahaas,
waayo, Ilaah baa isaga nasiyey. 7 Oo wuxuu dadkii Yahuudah
ku yidhi, Kaalaya aan magaalooyinkan dhisnee oo aan u
yeelno derbiyo, iyo munaarado, iyo irdo, iyo qataarro; dalku
weli waa ina hor yaal, maxaa yeelay, waxaynu doondoonnay
Rabbiga Ilaaheenna ah; isagaynu doondoonnay, oo isna
dhan kasta ayuu inaga nasiyey. Markaasay magaalooyinkii
dhiseen, wayna liibaaneen. 8 Oo Aasaana wuxuu lahaa
ciidan gaashaammo iyo warmo sita, oo waxaa reer Yahuudah
ka soo baxay saddex boqol oo kun, reer Benyaamiinna
waxaa ka soo baxay kuwo gaashaammo sita oo qaansooyin
xoota oo ah laba boqol iyo siddeetan kun, oo kulligoodna
waxay wada ahaayeen rag xoog badan. 9 Oo waxaa iyagii
ku soo kacay Serax oo ahaa reer Itoobiya isagoo wata ciidan
tiradiisu tahay malyuun, iyo saddex boqol oo gaadhifaras,
oo isagu wuxuu yimid Maareeshaah. 10 Markaasaa Aasaa
u baxay inuu isaga ka hor tago, oo waxay dagaal isugu
diyaariyeen Dooxadii Sefaataah oo Maareeshaah u dhow.
11 Markaasaa Aasaa u qayshaday Rabbiga Ilaahiisa ah
oo yidhi, Rabbiyow, adiga mooyaane ma jiro mid u kala
hiilin kara kan itaalka badan iyo kan aan xoogga lahayn.
Rabbiyow Ilaahayagow, na caawi, waayo, waannu isku kaa
hallaynaynaa, oo magacaaga ayaannu dadkan badan ugu
soo baxnay. Rabbiyow, waxaad tahay Ilaahayaga, haddaba
ninna yuusan kaa adkaan. 12 Oo sidaas daraaddeed Aasaa
iyo dadkii Yahuudah hortooda ayaa Rabbigu ku jebiyey
kuwii reer Itoobiya, kuwii reer Itoobiyana way carareen. 13
Markaasaa Aasaa iyo dadkii la socday u eryadeen xagga
Geraar, oo waxaa kuwii reer Itoobiya ka dhintay dad faro
badan oo iyaga ayan ka soo kaban karin, maxaa yeelay,
iyagu waxay ku hor baabbe'een Rabbiga iyo ciidankiisaba,
oo weliba waxay kala tageen maal booli ah oo aad u
badan. 14 Oo waxay kaloo wax ku dhufteen magaalooyinkii
Geraar ku wareegsanaa oo dhan, waayo, iyaga waxaa ku
dhacday Rabbiga cabsidiisii, oo magaalooyinkii oo dhanna
way dhaceen, maxaa yeelay, waxaa iyaga ku jiray maal
badan. 15 Oo haddana waxay burburiyeen teendhooyinkii
xoolodhaqatada, waxayna dhaceen ido faro badan iyo geel.
Dabadeedna Yeruusaalem bay ku noqdeen.

**15** Markaasaa Ruuxii Ilaah wuxuu ku soo degay Casaryaah
oo ahaa ina Codeed, 2 oo intuu u soo baxay inuu Aasaa
ka hor tago ayuu ku yidhi, Aasaa, iyo dadkii Yahuudah iyo
Benyaamiin oo dhammow, i maqla. Rabbigu wuu idinla jiraa
intaad isaga la jirtaan, oo haddaad isaga doondoontaanna

waad heli doontaan, laakiinse haddaad isaga ka tagtaan,
isna wuu idinka tegi doonaa. 3 Haddaba intii wakhti dheer
ah dadka Israa'iil ma ay haysan Ilaaha runta ah, iyo wadaad
iyaga wax bara, iyo sharci toona, 4 laakiinse markay cidhiidhi
galeen ayay u soo jeesteen oo doondooneen Rabbiga ah
Ilaaha reer binu Israa'iil, wayna heleen. 5 Oo waayahaas oo
dhanna nabadu uma jirin kii dibadda u baxa iyo kii gudaha
soo gala toona, laakiinse dadka dalalka deggan oo dhan
waxaa kor saarnaa dhibaatooyin waaweyn. 6 Oo iyagii
way kala burbureen, oo quruumuba quruun bay ka gees
noqotay, magaalona magaalay ka gees noqotay, waayo,
Ilaah baa ku dhibay cidhiidhi oo dhan. 7 Laakiinse idinku
xoogaysta oo gacmihiinnu yay debcin, waayo, shuqulkiinna
waa laydiinka abaalgudi doonaa. 8 Oo Aasaana markuu
maqlay erayadaas iyo waxsheegiddii Nebi Codeed ayuu
sii dhiirranaaday, oo dalka Yahuudah iyo kan Benyaamiin
oo dhan iyo magaalooyinkii uu ka qabsaday dalka buuraha
leh oo reer Efrayim wuu ka wada fogeeyey karaahiyadii,
oo weliba wuxuu cusboonaysiiyey meeshii allabariga ee
Rabbiga oo ku hor tiil balbalada Rabbiga. 9 Markaasuu
soo wada shiriyey dadkii Yahuudah iyo dadkii Benyaamiin
iyo kuwii iyaga la degganaa oo ka yimid reer Efrayim iyo
reer Manaseh iyo reer Simecoonba, waayo, isagay ku soo
darmeen iyagoo tiro badan, markay arkeen in Rabbiga
Ilaahiisa ahu uu isaga la jiro. 10 Sidaas daraaddeed waxay
ku soo urureen Yeruusaalem sannaddii shan iyo tobnaad oo
boqortooyadii Aasaa bisheedii saddexaad. 11 Oo maalintaas
waxay Rabbiga ugu allabaryeen toddoba boqol oo dibi
iyo toddoba kun oo neef oo ido ah oo ka mid ah dhicii
ay keeneen. 12 Oo waxay axdi ku galeen inay Rabbiga
Ilaaha awowayaashooda ah ku doondoonaan qalbigooda oo
dhan iyo naftooda oo dhan, 13 iyo in la dilo ku alla kii aan
doondoonin Rabbiga ah Ilaaha reer binu Israa'iil, hadduu yar
yahay iyo hadduu weyn yahay, ama hadduu nin yahay iyo
hadday naag tahayba. 14 Oo waxay Rabbiga ugu dhaarteen
cod weyn iyo qaylo iyo turumbooyin iyo buunan. 15 Oo
dadkii Yahuudah oo dhammu way ku reyreeyeen dhaartii,
maxaa yeelay, qalbigooda oo dhan ayay ku dhaarteen,
oo waxay isaga ku doondooneen xiisahooda oo dhan,
wayna heleen, oo Rabbiguna hareerahooda oo dhan wuu ka
nasiyey. 16 Oo weliba Macakaah oo ahayd Boqor Aasaa
hooyadiis boqoradnimadii wuu ka dejiyey, maxaa yeelay,
waxay sanam karaahiya ah u samaysay geed Asheeraah,
oo Aasaa sanamkeedii wuu jebiyey oo wuxuu ka dhigay
boodh, wuxuuna ku gubay durdurka Qidroon agtiisa. 17
Laakiinse meelihii sarsare dalka Israa'iil lagama baabbi'in,
habase yeeshee Aasaa qalbigiisu wuu qummanaa cimrigiisii
oo dhan. 18 Oo gurigii Ilaah wuxuu soo geliyey alaabtii
aabbihiis quduuska ka dhigay iyo alaabtii uu isaga qudhiisu
quduuska ka dhigay, waxayna ahayd lacag iyo dahab iyo
weelal. 19 Oo dagaal dambena ma jirin ilaa sannaddii shan
iyo soddonaad ee Aasaa boqornimadiisii.

**16** Oo boqornimadii Aasaa sannaddeedii lix iyo soddonaad
ayaa Bacshaa oo ahaa boqorkii dalka Israa'iil dalka
Yahuudah ku kacay oo wuxuu dhisay Raamaah, inuusan
qofna u oggolaan inuu ka baxo ama u galo Aasaa oo ahaa
boqorkii dalka Yahuudah. 2 Markaasaa Aasaa lacag iyo
dahab ka soo bixiyey khasnadihii guriga Ilaah iyo kuwii
guriga boqorkaba, oo wuxuu u sii dhiibay Benhadad oo ahaa
boqorkii Suuriya oo Dimishaq degganaa, oo wuxuu ku yidhi,
3 Axdi baa inoo dhexeeya aniga iyo adiga, oo aabbahay iyo
aabbahaana wuu u dhexayn jiray, haddaba bal eeg waxaan
kuu soo diray lacag iyo dahab, saas aawadeed tag oo jebi
axdiga aad la leedahay boqorka dalka Israa'iil oo Bacshaa ah,
ha iga tagee. 4 Markaasaa Benhadad dhegaystay hadalkii
Boqor Aasaa, oo saraakiishii ciidammadiisa ayuu u diray
magaalooyinkii dalka Israa'iil, oo waxay dagaal ku dhufteen
Ciyoon, iyo Daan, iyo Aabeel Mayim, iyo magaalooyinkii
wax lagu kaydin jiray oo reer Naftaali oo dhan. 5 Kolkii
Bacshaa taas maqlay wuu ka tegey Raamaah dhisiddeedii,
oo shuqulkiisiina wuu joojiyey. 6 Markaasaa Boqor Aasaa
soo kaxaystay dadkii Yahuudah oo dhan, oo waxay wada
qaadeen dhagxantii iyo alwaaxdii Raamaah oo uu Bacshaa
ku dhisayay, kolkaasuu ku dhisay Gebac iyo Misfaah. 7
Oo wakhtigaas ayaa Xanaanii oo waxarkihii ahaa u yimid
Aasaa oo ahaa boqorkii dalka Yahuudah, oo wuxuu ku yidhi,
Waxaad isku hallaysay boqorka Suuriya, oo iskuma aadan
hallayn Rabbiga Ilaahaaga ah, haddaba sidaas daraaddeed
ciidanka boqorka Suuriya gacantaada wuu ka baxsaday. 8
War kuwii reer Itoobiya iyo reer Luubiim sow ma ay ahayn
ciidan weyn oo wata gaadhifardood iyo ciidan fardooley
ah oo aad iyo aad u badan? Oo weliba Rabbigu wuxuu
soo geliyey gacantaada, maxaa yeelay, Rabbiga waad
isku hallaysay. 9 Waayo, Rabbiga indhihiisu waxay hor iyo
dib u fiirinayaan dunida oo dhan inuu isu adkeeyo kuwa
qalbigoodu isaga xaggiisa ku qumman yahay. Taas ayaad
nacasnimo ku samaysay, oo hadda ka dib dagaallo baad ku
jiri doontaa. 10 Markaasaa Aasaa waxarkihii u cadhooday oo
wuxuu ku riday xabsi, maxaa yeelay, aad buu ugu xanaaqay
xaalkan daraaddiis. Oo isla markaasna Aasaa baa dadkii
qaarkiis dulmay. 11 Oo bal eeg Aasaa falimihiisii, intii hore
iyo intii dambeba, waxay ku qoran yihiin kitaabkii boqorrada
dalka Yahuudah iyo dalka Israa'iil. 12 Oo sannaddii sagaal

iyo soddonaad oo boqornimadiisa ayaa Aasaa cagaha ka
bukooday, oo cudurkiisiina aad iyo aad buu u weynaa, oo
weliba isagu cudurkiisii Rabbiga uma uu doonin laakiinse
wuxuu u doondoonay dhakhtarrada. 13 Oo sannaddii kow
iyo afartanaad oo boqornimadiisa ayaa Aasaa dhintay oo la
seexday awowayaashiis. 14 Oo waa lagu aasay qabriyadiisii
uu ka qotay magaaladii Daa'uud, oo waxaa lagu jiifiyey sariir
ay ka buuxaan cadar udgoon iyo uunsi kala cayn cayn ah oo
lagu hagaajiyey sancada kuwa cadarka sameeya, oo waxaa
loo sameeyey dabshid aad u weyn.

**17** Oo waxaa meeshiisii boqor ka noqday wiilkiisii
Yehooshaafaad, oo wuxuu u xoogaystay si uu dadka
Israa'iil isaga daafaco. 2 Oo wuxuu ciidan fadhiisiyey
magaalooyinkii deyrka lahaa oo dalka Yahuudah oo dhan,
oo rugo askareedna ayuu dhex dhigay dalkii Yahuudah
iyo weliba magaalooyinkii reer Efrayim oo aabbihiis Aasaa
uu mar hore qabsaday. 3 Oo Rabbiguna Yehooshaafaad
wuu la jiray, maxaa yeelay, wuxuu ku socday jidkii hore
oo awowgiis Daa'uud, oo Bacaliimna ma uu doonin,
4 laakiinse wuxuu doonay Ilaahii awowgiis, oo wuxuu
ku socday amarradiisii, mana uu yeelin falimihii dadka
Israa'iil. 5 Oo sidaas daraaddeed Rabbigu boqortooyadii
gacantiisuu ku xoogeeyey, oo dadkii Yahuudah oo dhammuna
Yehooshaafaad ayay hadiyado u keeni jireen, oo isagu
wuxuu lahaa maal iyo sharaf badan. 6 Oo qalbigiisuna
wuxuu u sara kacay inuu qaado jidadka Rabbiga, oo
weliba wuxuu dalka Yahuudah ka baabbi'iyey meelihii
sarsare iyo geedihii Asheeraah. 7 Oo haddana sannaddii
saddexaad oo boqortooyadiisa ayuu diray amiirradiisii oo
ahaa Benxayl, iyo Cobadyaah, iyo Sekaryaah, iyo Netaneel,
iyo Miikaayaah inay magaalooyinka dalka Yahuudah dadka
wax ku baraan, 8 oo wuxuu la diray kuwii reer Laawi oo
ahaa Shemacyaah, iyo Netanyaah, iyo Sebadyaah, iyo
Casaaheel, iyo Shemiiraamood, iyo Yehoonaataan, iyo
Adoniiyaah, iyo Toobiyaah, iyo Toob Adooniyaah, oo waxaa
kaloo iyaga la jiray wadaaddadii ahaa Eliishaamaac iyo
Yehooraam. 9 Oo iyana dalka Yahuudah ayay dadka wax ku
bareen iyagoo wata kitaabkii sharciga Rabbiga, oo waxay
ku dhex wareegeen magaalooyinkii dalka Yahuudah oo
dhan, oo dadkiina wax bay bareen. 10 Oo boqortooyooyinkii
dalalkii ku wareegsanaa dalka Yahuudah oo dhan waxaa
ku dhacday Rabbiga cabsidiisii, oo sidaas daraaddeed
iyagu Yehooshaafaad lama ayan diririn. 11 Oo reer Falastiin
qaarkood ayaa Yehooshaafaad u keenay gabbaro iyo lacag
baad ah, oo weliba Carabtiina waxay u keeneen adhi badan
oo ah toddoba kun iyo toddoba boqol oo wan iyo toddoba
kun iyo toddoba boqol oo orgi. 12 Oo Yehooshaafaadna aad
iyo aad buu u sii weynaaday, oo wuxuu dalka Yahuudah ka
dhex dhisay qalcado iyo magaalooyin wax lagu kaydiyo.
13 Oo magaalooyinka dalka Yahuudah waxaa loogu dhex
sameeyey shuqullo badan, oo Yeruusaalemna waxaa u
joogay rag dagaalyahan ah oo xoog badan. 14 Oo tanuna
waa tiradoodii iyo sidii ay reerahoodu kala ahaayeen,
saraakiishii kun kun u talin jiray ee dadkii Yahuudah waxaa
ka joogay Cadnaah oo sirkaal ahaa, oo waxaa isaga la
jiray rag xoog badan oo ah saddex boqol oo kun, 15 oo
waxaa isaga ku xigay Yehooxaanaan oo sirkaal ahaa, oo
waxaa isaga la jiray laba boqol iyo siddeetan kun oo nin, 16
oo isna waxaa ku xigay Camasyaah ina Sikrii oo Rabbiga
ikhtiyaarkiisa isugu bixiyey, oo isna waxaa la jiray laba boqol
oo kun oo ah rag xoog badan. 17 Oo reer Benyaamiinna
waxaa ka joogay Elyaadaac oo ahaa nin xoog badan, oo
isna waxaa la jiray laba boqol oo kun oo nin oo sita qaanso
iyo gaashaan, 18 oo isna waxaa ku xigay Yehoosaabaad,
waxaana isaga la jiray boqol iyo siddeetan kun oo nin oo
dagaal loo diyaariyey. 19 Oo kuwanu waxay ahaayeen intii
boqorka u adeegi jirtay, oo ayan ku jirin kuwii uu boqorku
fadhiisiyey magaalooyinkii deyrka lahaa oo dalka Yahuudah
ku yiil oo dhan.

**18** Haddaba Yehooshaafaad wuxuu lahaa maal iyo sharaf
badan, xidhiidh buuna la yeeshay Axaab. 2 Oo
dhawr sannadood dabadood isagu wuxuu Axaab ugu tegey
Samaariya. Oo Axaabna isagii iyo dadkiisii la socdayba
wuxuu u qalay ido iyo dibi faro badan, oo wuxuuna isagii
oggolaysiiyey inuu ula kaco Raamod Gilecaad. 3 Markaasaa
Axaab oo ahaa boqorkii dalka Israa'iil Yehooshaafaad oo
ahaa boqorkii dalka Yahuudah ku yidhi, Ma ii raacaysaa
Raamod Gilecaad? Oo isna wuxuu ugu jawaabay, Anigu
kula mid baan ahay, oo dadkayguna waa dadkaagoo kale,
oo annaguna dagaalka waan idinla gelaynaa. 4 Markaasaa
Yehooshaafaad boqorkii dalka Israa'iil ku yidhi, Waan ku
baryayaaye bal maanta erayga Rabbiga wax weyddii. 5
Markaasaa boqorkii dalka Israa'iil soo wada ururiyey nebiyadii
oo ahaa afar boqol oo nin, oo wuxuu ku yidhi, Raamod
Gilecaad dagaal ma u tagnaa mise waan iska daaya? Oo
iyana waxay ku yidhaahdeen, Tag, waayo, Ilaah wuxuu
iyada soo gelin doonaa gacantaada, boqorow. 6 Laakiinse
Yehooshaafaad wuxuu ku yidhi, Kuwan mooyaane miyaanu
nebiga Rabbiga jirin aan wax weyddiinnee? 7 Markaasaa
boqorkii dalka Israa'iil wuxuu Yehooshaafaad ku yidhi, Weli
waxaa jira nin kale oo aan Rabbiga wax ka weyddiin karno,
laakiinse isaga waan nebcahay, waayo, isagu marnaba
wax wanaagsan igama sheego, illowse had iyo goorba

wax xun buu iga sheegaa. Kaasu waa Miikayhuu ina
Yimlaah. Markaasaa Yehooshaafaad wuxuu yidhi, Boqorow,
saas ha odhan. 8 Markaasaa boqorkii dalka Israa'iil u
yeedhay mid sirkaal ah, oo wuxuu ku yidhi, Haddiiba ii
keen Miikayhuu ina Yimlaah. 9 Haddaba boqorkii dalka
Israa'iil iyo Yehooshaafaad oo ahaa boqorkii dalka Yahuudah
mid kastaaba wuxuu ku fadhiyey carshigiisii, isagoo dharkii
boqornimada qaba, oo waxay fadhiyeen meel bannaan
oo ku taal iridda Samaariya laga soo galo, oo nebiyadii
oo dhammuna hortooday wax ku sii sheegayeen. 10 Oo
Sidqiyaah ina Kenacanaah ayaa samaystay geeso bir ah, oo
wuxuu yidhi, Waxaa Rabbigu leeyahay, Kuwan waad ku
hardiyi doontaa reer Suuriya ilaa ay wada baabba'aan. 11 Oo
nebiyadii oo dhammuna saasay sii wada sheegeen, iyagoo
leh, Raamod Gilecaad tag oo guulayso, maxaa yeelay,
Rabbigu wuu soo gelin doonaa gacantaada, boqorow. 12 Oo
wargeeyskii Miikayhuu loo diray inuu u soo yeedho wuu la
hadlay oo ku yidhi, Bal eeg, nebiyadii war wanaagsan bay u
sheegeen boqorkii, oo isku af bay ku wada hadleen. Haddaba
waxaan kaa baryayaa in eraygaagu la mid noqdo eraygooda,
oo adigu wax wanaagsan ku hadal. 13 Markaasaa Miikayhuu
yidhi, Rabbiga noloshiisaan ku dhaartaye waxaan sheegayaa
wax alla wixii Rabbigu yidhaahdo. 14 Oo markuu boqorkii
u yimid ayaa boqorkii ku yidhi, Miikayhuuyow, Raamod
Gilecaad dagaal ma u tagnaa mise waan iska daayaa? Oo
isna wuxuu ku yidhi, Taga oo ku soo guulaysta, oo iyagana
gacantiinnaa la soo gelin doonaa. 15 Markaasaa boqorkii
isagii ku yidhi, Runta mooyaane wax kale inaadan magaca
Rabbiga iigu sheegayn intee jeer baan ku dhaariyaa? 16
Oo isna wuxuu yidhi, Waxaan arkay dadka Israa'iil oo dhan
oo buuraha ku kala firdhay sidii ido aan adhijir lahayn. Oo
Rabbigu wuxuu yidhi, Kuwanu sayid ma leh ee nin waluba
gurigiisii ha ku nabad noqdo. 17 Markaasaa boqorkii dalka
Israa'iil Yehooshaafaad ku yidhi, Miyaanan kuu sheegin
inuusan wax wanaagsan iga sii sheegayn wax shar ah
mooyaane? 18 Markaasuu Miikayhuu yidhi, Haddaba erayga
Rabbiga maqla, Waxaan arkay Rabbiga oo carshigiisa ku
fadhiya oo ciidankii samada oo dhammuna taagan yihiin
midigtiisa iyo bidixdiisa. 19 Markaasaa Rabbigu yidhi, Kumaa
Axaab oo ah boqorka dalka Israa'iil soo sasabaya inuu
Raamod Gilecaad tago oo halkaas ku dhinto? Oo mid
sidanuu ku hadlay, mid kalena sidaasuu ku hadlay. 20
Markaasaa ruux soo baxay oo Rabbiga hortiisa istaagay, oo
yidhi, Anigaa soo sasabaya. Kolkaasaa Rabbigu ku yidhi,
Sidee baad u soo sasabaysaa? 21 Isna wuxuu yidhi, Anigu
waan tegayaa oo waxaan noqonayaa ruux beenlow ah oo
afka nebiyadiisa oo dhan ku jira. Oo Rabbigu wuxuu yidhi,
Adigu waad sasabi doontaa oo weliba waad ka adkaan
doontaa, haddaba tag oo saas yeel. 22 Haddaba bal eeg,
Rabbigu afka nebiyadaadan wuxuu geliyey ruux beenlow
ah, oo Rabbigu wuxuu kaa sheegay wax belaayo ah. 23
Markaasaa Sidqiyaah ina Kenacanaah intuu Miikayhuu
u soo dhowaaday dhabanka ku dhuftay, oo wuxuu ku
yidhi, War ruuxii Rabbigu xaggee buu iga maray inuu kula
hadlo? 24 Kolkaasaa Miikayhuu ku yidhi, Waad arki doontaa
maalinta aad qol hoose u geli doonto inaad ku dhuumato. 25
Markaasaa boqorkii dalka Israa'iil yidhi, Miikayhuu qabta oo
u celiya Aamoon oo ah taliyaha magaalada, iyo Yoo'aash oo
ah ina boqor, 26 oo waxaad ku tidhaahdaan, Boqorkii wuxuu
leeyahay, Ninkan xabsiga geliya, oo waxaad ku quudisaan
kibis dhib ah, oo waxaad ka waraabisaan biyo dhib ah, ilaa
aan soo nabad noqdo. 27 Markaasaa Miikayhuu ku yidhi,
Sinaba haddaad ku soo nabad noqotid, Rabbigu igama dhex
hadlin. Oo wuxuu kaloo yidhi, Dadkoo dhammow, maqla.
28 Markaasay boqorkii dalka Israa'iil iyo Yehooshaafaad
oo ahaa boqorkii dalka Yahuudah Raamod Gilecaad u
kaceen. 29 Oo boqorkii dalka Israa'iil wuxuu Yehooshaafaad
ku yidhi, Anigu waan ismidab qarinayaa oo dagaalkaan dhex
gelayaa, laakiinse adigu dharkaaga xidho. Oo boqorkii dalka
Israa'iil wuu ismidab qariyey oo dagaalkuu dhex galay. 30
Haddaba boqorkii dalka Suuriya wuxuu amray saraakiishii u
taliyey gaadhifardoodkiisa, oo ku yidhi, Mid weyn iyo mid
yar toona ha la diririna boqorka dalka Israa'iil oo keliya
mooyaane. 31 Oo markii saraakiishii gaadhifardoodku ay
Yehooshaafaad arkeen ayay isku yidhaahdeen, Kanu waa
boqorkii dalka Israa'iil. Markaasay ku leexdeen inay la
diriraan aawadeed, laakiinse Yehooshaafaad wuu qayliyey,
oo Rabbiguna wuu caawiyey, oo Ilaah baa iyagii ka ceshay.
32 Oo markii saraakiishii gaadhifardoodku ay arkeen inuusan
ahayn boqorkii dalka Israa'iil ayay dib uga noqdeen. 33 Oo
nin baa intuu qaansadiisii xooday kama' ahaan fallaadh u
ganay, oo wuxuu boqorkii dalka Israa'iil kaga dhuftay meesha
dharkiisa dagaalku isaga yimaadaan. Markaasuu boqorku kii
gaadhifaraskiisa kaxaynayay ku yidhi, Gacantaada leexi oo
ciidanka iga dhex bixi, waayo, aad baan u dhaawacmay. 34
Oo maalintaas dagaalkii waa sii kordhay, habase yeeshee tan
iyo makhribkii boqorkii dalka Israa'iil ayaa gaadhifaraskiisa
isdhex taagay isagoo ka hor jeeda dadkii Suuriya, oo goor
qorraxdhicii ku dhow ayuu dhintay.

19 Markaasaa Yehooshaafaad oo ahaa boqorkii dalka
Yahuudah nabad ugu noqday gurigiisa Yeruusaalem
ku yaal. 2 Oo waxaa baxay oo isagii ka hor tegey
Yeehuu ina Xanaanii oo wax arkihii ahaa, oo wuxuu Boqor
Yehooshaafaad ku yidhi, War ma waxaa kuu ekayd inaad

caawiso kuwa sharka ah iyo inaad jeclaato kuwo Rabbiga
neceb? Waxan daraaddiis waxaa kugu soo degtay cadho
Rabbiga hortiisa ka timid. 3 Habase ahaatee waxyaalo
wanaagsan baa lagaa helay, maxaa yeelay, waxaad dalka
ka saartay geedihii Asheeraah, oo qalbigaagana waxaad u
diyaarisay inaad Rabbiga doondoonto. 4 Yehooshaafaad
wuxuu degganaan jiray Yeruusaalem, oo haddana wuxuu
dhex maray dadkii tan iyo Bi'ir Shebac iyo ilaa dalka
buuraha leh oo reer Efrayim, oo iyagii wuxuu u soo
celiyey Rabbiga ah Ilaahii awowayaashood. 5 Oo dalkii oo
dhan iyo magaalooyinkii deyrka lahaa oo dadka Yahuudah
wuxuu magaalo ka magaalo fadhiisiyey xaakinno. 6 Oo
xaakinnadiina wuxuu ku yidhi, Waxa aad samaynaysaan ka
fiirsada, waayo, idinku garsoorid dad u samayn maysaan,
laakiinse waxaad u samaynaysaan Rabbiga, oo weliba
isaguna garsooridda wuu idinla weheliyaa. 7 Haddaba
sidaas daraaddeed Rabbiga ka cabsada, iska jira, oo saas
yeela, waayo, xagga Rabbiga Ilaaheenna ah dembi ma
jiro, dadkana looma kala eexdo, laaluushna lama qaato. 8
Oo markay Yeruusaalem ku noqdeen ayaa Yehooshaafaad
weliba Yeruusaalemna fadhiisiyey kuwii reer Laawi iyo
wadaaddadii iyo madaxdii reeraha dadka Israa'iil inay
sameeyaan Rabbiga garsooriddiisa iyo inay kuwii murma u
garsooraan. 9 Oo wuxuu iyagii amray oo ku yidhi, Saas yeela
idinkoo Rabbiga ka cabsanaya oo aamin ah oo qalbigiinnu
qumman yahay. 10 Oo mar alla markii dacwo idiinka timaado
walaalihiinna magaalooyinkooda deggan, taasoo u dhexaysa
oo ah dhiig iyo dhiig, iyo sharci iyo amar, iyo qaynuun
iyo xukummo, de markaas waa inaad u digtaan si aanay
Rabbiga ugu dembaabin, oo aan taas aawadeed cadhada
Rabbigu ugu soo degin idinka iyo walaalihiinba. Saas
yeela oo eed lahaan maysaan. 11 Oo bal eega, axwaasha
Rabbiga oo dhan waxaa idiinku sarrayn doona Amaryaah ah
wadaadka sare, oo axwaasha boqorka oo dhanna waxaa
idiinku sarrayn doona Sebadyaah ina Ismaaciil oo ah taliyaha
reer Yahuudah, oo weliba reer Laawina hortiinnay saraakiil
ku ahaan doonaan. Haddaba dhiirranaada oo Rabbiguna ha
la jiro kuwii wanaagga sameeya.

**20** Oo taas dabadeedna waxaa Yehooshaafaad ku soo
kacay inay la diriraan reer Moo'aab iyo reer Cammoon
iyo qaar kale oo reer Cammoon ahaa. 2 Markaasaa qaar
yimid oo waxay Yehooshaafaad u soo sheegeen oo ku
yidhaahdeen, Waxaa kugu soo socda col faro badan oo
ka imanaya badda shishadeeda iyo dalka Suuriya, oo bal
eeg haatan waxay joogaan Xasason Taamaar oo ah Ceyn
Gedii. 3 Kolkaasaa Yehooshaafaad cabsaday, oo wuxuu isu
diyaariyey inuu Rabbiga doondoono, oo dalkii Yahuudah oo
dhanna soon buu ku naadiyey. 4 Markaasay dadkii Yahuudah
oo dhammu iswada urursadeen inay Rabbiga caawimaad
ka weyddiistaan, oo xataa magaalooyinkii dalka Yahuudah
oo dhan way uga soo baxeen inay Rabbiga doondoonaan.
5 Markaasa Yehooshaafaad isdhex taagay shirkii dadka
Yahuudah iyo Yeruusaalem iyagoo jooga guriga Rabbiga
iyo barxadda cusub horteeda, 6 oo wuxuu yidhi, Rabbiyow
Ilaahii awowayaashayow, sow ma ahid Ilaaha samada ku
jira? Oo sow ma ahid kan u taliya kulli boqortooyooyinka
quruumaha oo dhan? Oo gacantaadana waxaa ku jira xoog
iyo itaal oo sidaas daraaddeed ninna kuma hor istaagi karo.
7 Ilaahayagow, dadkii dalkan degganaa sow kama aad eryin
dadkaaga reer binu Israa'iil hortooda, oo weligiisba sow ma
aadan siin saaxiibkaagii Ibraahim farcankiisii? 8 Haddaba
iyagu way dhex degganaan jireen, oo waxay magacaaga
aawadiis uga dhex dhiseen meel quduus ah, oo waxay
yidhaahdeen, 9 Markii wax shar ahu ay nagu dhacaan
hadday yihiin seef ama xukun ama belaayo ama abaar,
annagu waxaan soo hor istaagi doonnaa gurigan iyo adiga,
(waayo, magacaagu wuxuu ku jiraa gurigan), markaasaannu
kuu qayshan doonnaa annagoo dhib ku jirna, oo adna
waad na maqli doontaa oo waad na badbaadin doontaa.
10 Haddaba bal eeg reer Cammoon iyo reer Moo'aab iyo
reer Buur Seciir oo aad reer binu Israa'iil markay dalka
Masar ka soo baxeen u diidday inay dalkooda galaan,
laakiinse gees bay uga leexdeen oo mana ay baabbi'in. 11
Bal eeg siday noogu abaalgudeen oo ay noogu soo baxeen
iyagoo doonaya inay naga tuuraan hantidaadii aad dhaxal
ahaan noo siisay. 12 Ilaahayagow, miyaadan iyaga xukumi
doonayn? Waayo, annagu itaal uma hayno guutadan weyn
oo nagu soo socota, oo weliba wax aannu samaynona ma
naqaan, laakiinse indhahayagu adigay kuu soo jeedaan.
13 Oo weliba dadka Yahuudah oo dhammu Rabbigay hor
taagnaayeen iyaga iyo dhallaankoodii iyo naagahoodii iyo
carruurtoodiiba. 14 Markaasaa ruuxii Rabbigu wuxuu ku
soo degay Yaxasii'eel ina Sekaryaah, kaasoo ahaa ina
Benaayaah, oo ahaa ina Yecii'eel, oo ahaa ina Matanyaah,
oo reer Aasaaf ahaa, oo reer Laawi ka sii ahaa, isagoo
shirka ku dhex jira. 15 Markaasuu yidhi, Kulligiin dadka
Yahuudah, iyo kuwiinna Yeruusaalem deggan, iyo adiga
Boqor Yehooshaafaad ahowba, wada maqla. Rabbigu wuxuu
idinku leeyahay, Dadkan faraha badan daraaddiis ha u
cabsanina, hana u qalbi jabina, waayo, dagaalka ma lihidin,
laakiinse Ilaah baa iska leh. 16 Haddaba idinku berrito u
dhaadhaca iyaga, oo bal eeg, waxay soo korayaan jiirta
Siis, oo waxaad ka heli doontaan meesha dooxadu ku

dhammaato oo ka horraysa cidlada Yeruu'eel. 17 Idinku uma
baahnaan doontaan inaad dagaalkan gashaan, haddaba
dadkii Yahuudah iyo dadkii Yeruusaalemow, joogsada,
oo iska taagnaada, oo eega badbaadada Rabbigu idin
badbaadinayo; berrito iyaga u baxa, oo ha cabsanina, hana
qalbi jabina, maxaa yeelay, Rabbiga ayaa idinla jira. 18
Markaasaa Yehooshaafaad madaxa fooororshay oo wejiga
dhulka saaray, oo dadkii Yahuudah iyo dadkii Yeruusaalem
degganaa oo dhammuna Rabbiga hortiisay isku tuureen oo
u sujuudeen. 19 Kolkaasaa kuwii reer Laawi oo ahaa reer
Qohaad iyo reer Qorax waxay u istaageen inay Rabbiga
ah Ilaaha reer binu Israa'iil cod aad iyo aad u weyn ku
ammaanaan. 20 Markaasay aroor hore kaceen oo waxay u
ambabbaxeen xagga cidladii Teqooca, oo intay baxayeen
ayaa Yehooshaafaad istaagay oo yidhi, Dadka Yahuudah iyo
kuwiinna Yeruusaalem degganow, i maqla, rumaysta Rabbiga
Ilaahiinna ah oo waad xoogaysan doontaan, oo rumaysta
nebiyadiisa oo waad liibaani doontaan. 21 Oo markuu dadkii
la tashaday ayuu doortay kuwii Rabbiga u gabyi lahaa oo
ammaani lahaa iyagoo dhar quduus ah qaba oo ciidanka hor
socda oo leh, Rabbiga ku mahadnaqa, waayo, naxariistiisu
weligeedba way waartaa. 22 Oo markay bilaabeen inay
gabyaan oo Ilaah ammaanaan ayaa Rabbigu rag gaadmo
ah ku soo kiciyey reer Cammoon iyo reer Moo'aab iyo
reer Buur Seciir oo ku soo kacay dadkii Yahuudah, oo
iyagii waa la laayay. 23 Waayo, reer Cammoon iyo reer
Moo'aab ayaa is hortaageen dadkii degganaa Buur Seciir
inay dhammaantood laayaan oo wada baabbi'iyaan, oo
markay wada baabbi'iyeen dadkii Buur Seciir degganaa
ayaa mid kastaaba kan kale ku caawiyey inuu nin kale dilo.
24 Oo dadkii Yahuudah markay yimaadeen meeshii dheerayd
ee cidlada ee wax laga dhawro ayay fiiriyeen dadkii faraha
badnaa, oo waxay arkeen inay yihiin meydad dhulka ku
dhacay, oo midna ma baxsan. 25 Oo Yehooshaafaad iyo
dadkiisii markay u yimaadeen inay iyaga furtaan waxay
dhexdoodii ka heleen maal badan oo meydadka la yaal iyo
alaab qaali ah oo ay nafsaddooda u furteen, oo waxaasuna
waxay qaadan karaan waa ka badnaayeen, oo intii saddex
maalmood ah ayay dhicii guranayeen, maxaa yeelay, aad
iyo aad buu u badnaa. 26 Oo maalintii afraad ayay ku
shireen dooxada Barako, waayo, halkaasay Rabbiga ku
ammaaneen, sidaas daraaddeed meeshaas magaceedii
waxaa loo bixiyey Dooxadii Barako, oo ilaa maantadanna
waa loo yaqaan. 27 Markaasaa dadkii Yahuudah iyo dadkii
Yeruusaalem oo dhammu iyagoo Yehooshaafaad u horreeyo
waxay ku noqdeen Yeruusaalem iyagoo faraxsan, waayo,
Rabbigu wuxuu kaga farxiyey libtii ay cadaawayaashoodii ka
heleen. 28 Oo Yeruusaalem iyo gurigii Rabbiga ayay soo
galeen iyagoo ka dhawaajinaya shareerado, iyo kataarado,
iyo turumbooyin. 29 Oo boqortooyooyinkii dalalka oo dhan
waxaa ku soo degtay Ilaah cabsidiis markay maqleen
in Rabbigu la diriray cadaawayaashii dadkii Israa'iil. 30
Sidaas daraaddeed Yehooshaafaad boqortooyadiisii way
xasilloonayd, waayo, Ilaahiis ayaa ka nasiyey hareerihiisa oo
dhan. 31 Yehooshaafaad boqor buu ka ahaa dalka Yahuudah,
oo markuu boqor noqday wuxuu jiray shan iyo soddon
sannadood, oo Yeruusaalemna shan iyo labaatan sannadood
buu boqor ku ahaa, oo hooyadiis magaceedana waxaa la
odhan jiray Casuubaah ina Shilxii. 32 Oo wuxuu ku socday
jidkii aabbihiis Aasaa oo geesna ugama uu leexan, oo wixii
Rabbiga hortiisa ku qummanaa ayuu sameeyey. 33 Habase
yeeshee meelihii sarsare lama baabbi'in, oo dadkuna weli
qalbigooda oo dhan ulama ay jeesan Ilaahii awowayaashood.
34 Haddaba Yehooshaafaad falimihiisii kale, intii hore iyo
intii dambeba, waxay ku qoran yihiin taariikhdii Yeehuu
ina Xanaanii taasoo ku qoran kitaabkii boqorrada dalka
Israa'iil. 35 Oo taas dabadeedna Yehooshaafaad oo ahaa
boqorkii dalka Yahuudah xidhiidh buu la yeeshay Axasyaah
oo ahaa boqorkii dalka Israa'iil kaasoo shuqulkiisii aad
iyo aad u xumaa, 36 oo wuxuu isagii kula heshiiyey inay
samaystaan doonniyo Tarshiish u dhoofa, oo doonniyihii
waxay ku samaysteen Cesyoon Geber. 37 Markaasaa
Eliiceser ina Dodaawaahuu oo ahaa reer Maareeshaah ayaa
Yehooshaafaad wax ka sii sheegay oo yidhi, Heshiiska aad
Axasyaah la heshiisay aawadiis ayaa Rabbigu u burburiyey
shuqulkaagii. Oo doonniyihiina way wada jajabeen, oo way
kari waayeen inay Tarshiish u dhoofaan.

21 Oo Yehooshaafaadna wuu dhintay oo la seexday
awowayaashiis, oo waxaa awowayaashiis lagula aasay
magaaladii Daa'uud, oo meeshiisiina waxaa boqor ka noqday
wiilkiisii Yehooraam. 2 Oo isna wuxuu lahaa walaalo oo ahaa
ilma Yehooshaafaad, waana Casaryaah, iyo Yexii'eel, iyo
Sekaryaah, iyo Casaryaah, iyo Miikaa'eel, iyo Shefatyaah,
oo intaas oo dhammu waxay ahaayeen ilma Yehooshaafaad
kii ahaa boqorkii dalka Israa'iil. 3 Oo aabbahoodna wuxuu
iyagii siiyey hadiyado waaweyn oo ah lacag, iyo dahab, iyo
waxyaalo qaali ah, oo weliba wuxuu ugu daray magaalooyin
deyr leh oo dalka Yahuudah ku yaal, laakiinse boqortooyadii
wuxuu siiyey Yehooraam, maxaa yeelay, wuxuu ahaa
curadkiisii. 4 Haddaba Yehooraam markuu boqortooyadii
aabbihiis fuulay oo uu aad u xoogaystay ayuu walaalihiis oo
dhan seef ku laayay, iyaga iyo kuwo kale oo ah amiirradii
dadka Israa'iil. 5 Oo Yehooraam markuu boqor noqday wuxuu

jiray laba iyo soddon sannadood, siddeed sannadoodna
boqor buu ku ahaa Yeruusaalem. 6 Oo wuxuu ku socday
jidkii ay boqorradii dalka Israa'iil mareen, sidii reerkii Axaab
yeelay oo kale, waayo, wuxuu qabay Axaab gabadhiisii,
oo wuxuu sameeyey wax Rabbiga hortiisa shar ku ah. 7
Habase yeeshee Rabbigu ma uu doonaynin inuu baabbi'iyo
reerkii Daa'uud, maxaa yeelay, axdi wuu la dhigtay, oo
wuxuu u ballanqaaday inuu isaga iyo carruurtiisa had
iyo goorba laambad siiyo. 8 Oo wakhtigiisii ayaa reer
Edom ka fallaagoobay dadka Yahuudah, oo iyana waxay
yeesheen boqor u taliya. 9 Markaasaa Yehooraam soo
gudbay isagoo wata saraakiishiisii iyo gaadhifardoodkiisii oo
dhan, oo intuu habeennimo kacay ayuu laayay reer Edom
oo hareereeyey isaga iyo saraakiishiisii gaadhifardoodka.
10 Reer Edomna way ka fallaagoobeen oo way ka hoos
baxeen gacantii dadka Yahuudah ilaa maantadan la joogo.
Oo haddana isla markaasba waxaa kaloo ka fallaagoobay
oo gacantiisii ka hoos baxay reer Libnaah, maxaa yeelay,
isagu wuxuu ka tegey Rabbigii ahaa Ilaaha awowayaashiis.
11 Oo weliba wuxuu buuraha dalka Yahuudah ka sameeyey
meelo sarsare, oo dadkii Yeruusaalem degganaana wuxuu
ka dhigay inay sanamyo raacaan, oo dadkii Yahuudahna
wuu habaabiyey. 12 Oo waxaa isagii u timid qorniin laga
keenay Nebi Eliiyaah, oo leh, Rabbiga aabbahaa Daa'uud
Ilaahiisa ahu wuxuu leeyahay, Adigu kuma aadan socon
jidadkii aabbahaa Yehooshaafaad maray iyo jidadkii Aasaa
oo boqorka dalka Yahuudah ahaa uu maray toona, 13
laakiinse waxaad ku socotay jidkii boqorrada dalka Israa'iil,
oo dadkii Yahuudah iyo dadkii Yeruusaalem degganaaba
waxaad ka dhigtay inay sanamyo raacaan sidii reerkii Axaab
yeelay oo kale, oo weliba waxaad laysay walaalahaa oo
reerka aabbahaa ka mid ahaa oo kaa wanaagsanaa, 14
haddaba sidaas daraaddeed bal eeg, Rabbigu belaayo weyn
ayuu ku dhufan doonaa dadkaaga, iyo carruurtaada, iyo
naagahaaga, iyo xoolahaaga oo dhanba. 15 Oo adigana
waxaa kugu dhici doona cudur weyn oo xiidmahaaga ayaa
bukan doona, ilaa xiidmahaagu ay kaa soo dhacaan maalin
ka maalin cudurka aad qabto daraaddiis. 16 Markaasaa
Rabbigu wuxuu Yehooraam ku soo kiciyey reer Falastiin iyo
reer Carabta oo ag joogay reer Itoobiya. 17 Oo waxay ku
soo kaceen dalka Yahuudah, oo way burburiyeen, waxayna
wada qaateen maalkii guriga boqorka yiil oo dhan, iyo weliba
wiilashiisii iyo naagihiisii, sidaas daraaddeed wiilna uma
hadhin isagii kii wiilashiisa ugu yaraa oo Yehoo'aaxaas la
odhan jiray mooyaane. 18 Oo waxaas oo dhan dabadood
Rabbigu wuxuu isaga xiidmihiisii ku dhuftay cudur aan la
bogsiin karin. 19 Oo wakhtigii waa iska socday, oo laba
sannadood dabadood waxay noqotay in xiidmihiisii la soo
dhacay cudurkii uu qabay daraaddiis, oo wuxuu u dhintay
cudurro xunxun. Oo dadkiisiina isaga dab uguma ay shidin
siday awowayaashiis dab ugu sharfi jireen oo kale. 20
Oo markuu boqor noqday wuxuu jiray laba iyo soddon
sannadood, oo Yeruusaalemna boqor buu ku ahaa siddeed
sannadood, oo wuxuu tegey oo dhintay isagoo aan la jeclayn,
oo waxaa lagu aasay magaalada Daa'uud, laakiinse laguma
aasin qabuurihii boqorrada.

22 Markaasaa dadkii Yeruusaalem degganaa waxay
meeshiisii boqor kaga dhigteen Axasyaah oo ahaa
wiilkiisii ugu wada yaraa, maxaa yeelay, guutadii ragga
ahayd oo reer Carbeed xerada la timid way wada laayeen
kuwii waaweynaa oo dhan. Sidaas daraaddeed waxaa boqor
noqday Axasyaah ina Yehooraam oo ahaa boqorkii dalka
Yahuudah. 2 Axasyaah markuu boqor noqday wuxuu jiray
laba iyo afartan sannadood, oo Yeruusaalemna sannad
ayuu boqor ku ahaa, oo hooyadiis magaceedana waxaa la
odhan jiray Catalyaah ina Coomrii. 3 Oo isaguna wuxuu
ku socday jidadkii reerka Axaab maray, waayo, hooyadiis
waxay kula talin jirtay inuu shar sameeyo. 4 Oo wuxuu
sameeyey wax Rabbiga hortiisa shar ku ah, sidii reerka
Axaab yeeli jiray oo kale, waayo, markii aabbihiis dhintay ka
dib iyagaa ahaan jiray lataliyayaashiisii ilaa uu baabba'ay. 5
Oo weliba wuxuu ku socon jiray taladoodii, wuuna raacay
Yehooraam ina Axaab oo ahaa boqorkii dalka Israa'iil inay
Xasaa'eel oo ahaa boqorkii Suuriya kula diriraan Raamod
Gilecaad, oo reer Suuriyana Yooraam bay dhaawaceen.
6 Markaasuu ku noqday Yesreceel in lagu soo daweeyo
nabrihii ay Raamaah kaga dhufteen markuu la diriray
Xasaa'eel oo ahaa boqorkii Suuriya. Markaasaa Axasyaah
ina Yehooraam oo ahaa boqorkii dalka Yahuudah tegey
inuu soo arko Yehooraam ina Axaab oo joogay Yesreceel,
maxaa yeelay, dhaawac buu ahaa. 7 Haddaba Axasyaah
baabbi'iisii wuxuu ka yimid xag Ilaah, markuu Yooraam u
tegey, maxaa yeelay, markuu yimid ayuu Yehooraam kula
kacay Yeehuu ina Nimshii kaasoo Rabbigu u subkay inuu
baabbi'iyo reerka Axaab. 8 Oo kolkii Yeehuu xukunka ku
soo dejinayay reerkii Axaab wuxuu helay amiirradii dalka
Yahuudah iyo Axasyaah walaalihiis wiilashii ay dhaleen
oo Axasyaah u adeegaya, markaasuu iyagii laayay. 9
Kolkaasuu doondoonay Axasyaah (oo Samaariya ku dhex
dhuumanayay), waana la soo qabtay oo waxaa loo keenay
Yeehuu, waana la dilay, oo isagii waa la aasay, waayo,
waxay isyidhaahdeen, Isaga waxaa dhalay Yehooshaafaad
oo Rabbiga ku doondooni jiray qalbigiisa oo dhan. Oo
Axasyaah reerkiisiina ma uu lahayn xoog uu boqortooyada

ku sii haysto. 10 Haddaba Catalyaah oo ahayd Axasyaah
hooyadiis markay aragtay in wiilkeedii dhintay ayay kacday
oo wada baabbi'isay farcankii reer boqor ee Yahuudah
oo dhan. 11 Laakiinse Yehooshabecad oo ahayd boqorka
gabadhiisii waxay la tagtay Yoo'aash oo ahaa ina Axasyaah,
oo ka dhex xadday wiilashii boqorka ee la laayay isagii iyo
tii xannaanayn jirtayba, oo waxay gelisay qolka la seexdo.
Haddaba Yehooshabecad oo ahayd Boqor Yehooraam
gabadhiis, oo u dhaxday wadaadkii Yehooyaadaac la odhan
jiray waxay isagii ka qarisay Catalyaah si ayan isaga u dilin
(maxaa yeelay, iyadu waxay ahayd Axasyaah walaashiis).
12 Oo intii lix sannadood ah ayuu kula qarsoonaa guriga
Ilaah, oo dalkiina waxaa u talisay Catalyaah.

**23** Haddaba sannaddii toddobaad ayaa Yehooyaadaac
xoog isgeliyey oo wuxuu soo kaxaystay oo axdi la
dhigtay boqol-u-taliyayaashii ahaa Casaryaah ina Yeroxaam,
iyo Ismaaciil ina Yehooxaanaan, iyo Casaryaah ina Coobeed,
iyo Macaseeyaah ina Cadaayaah, iyo Eliishaafaad ina Sikrii.
2 Oo iyana waxay ku soo wada wareegeen dalkii Yahuudah,
oo magaalooyinkii dalka Yahuudah oo dhan waxay ka soo
wada urursadeen kuwii reer Laawi iyo madaxdii qolooyinka
dadka Israa'iil oo waxay wada yimaadeen Yeruusaalem. 3
Markaasaa shirkii oo dhammu axdi boqorkii kula dhigtay
guriga Ilaah, oo wuxuu iyagii ku yidhi, Bal eega, boqorka
wiilkiisu isagaa boqor noqon doonee, sidii Rabbigu uu kaga
hadlay farcanka Daa'uud. 4 Haddaba idinku sidan yeela:
qaybtiinna saddexaad ee sabtida gasha oo ah reer Laawi iyo
wadaaddadu, waa inay ahaadaan iridjoogayaal albaabbada
jooga, 5 oo meel saddexaadna waa inay guriga boqorka
joogaan, meel saddexaadna ha joogeen iridda aasaaska
agteeda, oo dadka oo dhammuna waa inay ku wada jiraan
guriga Rabbiga barxadihiisa. 6 Laakiinse guriga Rabbiga
gudihiisa yuusan ninna soo gelin wadaaddada iyo kuwa
reer Laawi oo adeegaya mooyaane, iyagu ha soo galeen,
waayo, iyagu waa quduus, laakiinse dadka oo dhammu
waa inay Rabbiga amarkiisa dhawraan. 7 Oo reer Laawi
boqorka ha isku wareejiyeen iyadoo nin waluba hubkiisa
gacanta ku haysto, oo ku alla kii guriga gudihiisa soo gala
ha la dilo, oo idinku boqorkana la jira markuu baxayo iyo
markuu soo gelayoba. 8 Sidaas daraaddeed reer Laawi iyo
dadkii Yahuudah oo dhammuba way wada yeeleen wixii uu
wadaadkii Yehooyaadaac ahaa ku amray oo dhan, oo nin
waluba wuxuu kaxeeyey raggiisii sabtida geli lahaa iyo kuwii
sabtida bixi lahaaba, maxaa yeelay, wadaadkii Yehooyaadaac
ahaa ma uu kala dirin guutooyinkii. 9 Markaasaa wadaadkii
Yehooyaadaac ahaa boqol-u-taliyayaashii siiyey warmihii iyo
gaashaammadii waaweynaa iyo gaashaammadii yaryaraa
oo Boqor Daa'uud lahaa oo guriga Ilaah yiil. 10 Oo dadkii oo
dhanna wuxuu ka dhigay in nin waluba hubkiisa gacanta
ku haysto oo ay istaagaan guriga dhankiisa midig ilaa
dhankiisa bidix iyo tan iyo meesha allabariga agteeda
iyo guriga agtiisa, oo boqorkii bayna isku wareejiyeen.
11 Markaasay wiilka boqorka soo bixiyeen, oo waxay u
saareen taajkii, markhaatifurkiina way siiyeen, oo waxay
ka dhigeen boqor, oo Yehooyaadaac iyo wiilashiisiina intay
isagii subkeen ayay yidhaahdeen, Boqorku ha noolaado.
12 Oo Catalyaahna markay maqashay qayladii dadka iyo
iyagoo ordaya oo boqorka ammaanaya ayay dadkii ugu timid
gurigii Rabbiga. 13 Oo bal eeg, boqorku wuxuu ag taagnaa
tiirkiisii iridda u dhowaa, oo saraakiishii iyo kuwii turumbada
watayna boqorkay ag taagnaayeen, oo dadkii waddanka oo
dhammuna way reyreeyeen oo turumbooyin afuufeen, oo
kuwii gabayaaga ahaana waxay ka dhawaajiyeen alaabtii
muusikada oo waxay hoggaamiyeen kuwii qaaday gabaygii
ammaanta ahaa. Kolkaasaa Catalyaah dharkeedii iska
jeexjeexday oo waxay tidhi, Waa fallaagow! Waa fallaagow!
14 Markaasaa wadaadkii Yehooyaadaac ahaa soo bixiyey
boqol-u-taliyayaasha ciidanka u sarreeyey, oo wuxuu ku yidhi,
Iyada soo bixiya oo safafka dhex mariya, oo kii soo raacana
seef ha lagu dilo, waayo, wadaadku wuxuu yidhi, Iyada ha ku
dhex dilina guriga Rabbiga. 15 Sidaas daraaddeed iyadii meel
bay u banneeyeen, markaasay tagtay marinkii ay farduhu
guriga boqorka u mari jireen; oo halkaasay ku dileen. 16
Markaasaa Yehooyaadaac sameeyey axdi u dhexeeya isaga
qudhiisa iyo dadka oo dhan iyo boqorkaba inay ahaadaan
Rabbiga dadkiisa. 17 Dabadeedna dadkii oo dhammu
waxay tageen gurigii Bacal, oo way dumiyeen, oo meelihiisii
allabariga iyo sanamyadiisiiba way wada burburiyeen, oo
Mataan oo ahaa Bacal wadaadkiisiina waxay ku dileen
meelihii allabariga hortooda. 18 Markaasaa Yehooyaadaac
hawshii guriga Rabbiga u doortay wadaaddadii reer Laawi
ahaa oo Daa'uud ku dhex qaybiyey guriga Rabbiga, inay
qurbaannada la gubo oo Rabbiga u bixiyaan siday ugu
qoran tahay sharcigii Muuse, iyagoo faraxsan oo gabyaya
siduu ahaa amarkii Daa'uud. 19 Oo iridjoogayaashiina wuxuu
joojiyey irdihii guriga Rabbiga si uusan u soo gelin mid wax
ku nijaasoobay wax kasta ha ahaadee. 20 Oo haddana
wuxuu kaxeeyey boqol-u-taliyayaashii, iyo kuwii gobta ahaa,
iyo taliyayaashii dadka, iyo dadkii waddanka oo dhanba,
oo waxay boqorkii ka soo kaxeeyeen gurigii Rabbiga, oo
intay iriddii sare soo mariyeen ayay keeneen gurigii boqorka,
kolkaasay boqorkii ku fadhiisiyeen carshigii boqortooyada.
21 Sidaas daraaddeed dadkii waddanka oo dhammu way

wada reyreeyeen, oo magaaladiina way xasilloonayd, oo
Catalyaahna ayay seef ku dileen.

24 Yoo'aashna toddoba sannadood buu jiray markuu
boqor noqday, oo afartan sannadoodna Yeruusaalem
buu boqor ku ahaa, oo hooyadiis magaceeduna wuxuu
ahaa Sibyaah tii reer Bi'ir Shebac. 2 Oo Yoo'aashna
wuxuu sameeyey wixii Rabbiga hortiisa ku qummanaa
wakhtigii wadaadkii Yehooyaadaac ahaa noolaa oo dhan.
3 Oo Yehooyaadaacna wuxuu isagii u guuriyey laba
naagood, oo wuxuu dhalay wiilal iyo gabdhoba. 4 Oo
waxyaalahaas dabadoodna Yoo'aash wuxuu ku fikiray inuu
gurigii Rabbiga cusboonaysiiyo. 5 Markaasuu soo wada
ururiyey wadaaddadii iyo kuwii reer Laawi, oo wuxuu ku
yidhi, Baxa oo magaalooyinka dalka Yahuudah taga, oo
reer binu Israa'iil oo dhan waxaad ka soo ururisaan lacag
guriga Ilaahiinna lagu cusboonaysiiyo sannad ilaa sannad,
oo xaalkaas dhaqso u sameeya. Habase yeeshee kuwii
reer Laawi xaalkaas kuma ayan dhaqsan. 6 Markaasaa
boqorkii wuxuu u yeedhay Yehooyaadaac oo madax ahaa,
oo wuxuu ku yidhi, Maxaad u weyddiin weyday reer Laawi
inay dadkii Yahuudah iyo Yeruusaalem ka soo ururiyaan
cashuurtii Muuse oo ahaa addoonkii Rabbiga iyo tii shirka
reer binu Israa'iil teendhadii maragga aawadeed? 7 Waayo,
Catalyaah oo ahayd tu shar ah wiilasheedii ayaa gurigii
Ilaah burburiyeen, oo weliba alaabtii guriga Rabbiga oo
quduuska laga dhigay oo dhan waxay wada siiyeen Bacaliim.
8 Sidaas daraaddeed boqorkii wuu amray oo iyana waxay
sameeyeen sanduuq, oo waxay ag qotomiyeen guriga
Rabbiga iriddiisa dibaddeeda. 9 Markaasay dalka Yahuudah
iyo Yeruusaalem oo dhan ku naadiyeen in Rabbiga loo
keeno cashuurtii Muuse oo ahaa addoonkii Ilaah uu reer
binu Israa'iil kor saaray markay cidlada dhex joogeen. 10
Markaasaa amiirradii iyo dadkii oo dhammu reyreeyeen
oo intay wax keeneen ayay ku rideen sanduuqii ilaa ay
ka buuxiyeen. 11 Oo waxay noqotay in markii sanduuqii
la geeyey xafiiskii boqorka iyadoo ay reer Laawi sidaan,
oo la arkay in lacag badanu ku jirto ayaa waxaa yimid
oo sanduuqii ka shubay karraanigii boqorka iyo sirkaalkii
wadaadka sare, oo haddana sanduuqii bay qaadeen oo
meeshiisii ku celiyeen. Oo saasay maalin kasta yeeli jireen,
oo waxay soo ururiyeen lacag faro badan. 12 Oo boqorkii
iyo Yehooyaadaac waxay lacagtii siin jireen kuwii samayn
jiray hawshii adeegidda guriga Rabbiga, oo waxay soo
kiraysteen wastaadyo iyo nijaarro si ay u cusboonaysiiyaan
gurigii Rabbiga, oo waxay kaloo siin jireen kuwii bir iyo
naxaas wax uga samayn jiray si ay gurigii Rabbiga ugu
hagaajiyaan. 13 Markaasay shaqaalihii shaqeeyeen, oo
shuqulkiina gacantoodii buu ku hagaagay, oo gurigii Ilaahna
waxay ka dhigeen siduu ahaan jiray, wayna adkeeyeen. 14
Oo markay hawshii dhammeeyeen waxay lacagtii hadhay
keeneen boqorkii iyo Yehooyaadaac hortooda, oo taasna
waxaa gurigii Rabbiga looga sameeyey weelal, kuwaasoo
ahaa weelal lagu adeegi jiray iyo kuwa wax lagu bixin jiray,
iyo malgacadihii, iyo weelashii ahaa dahabka iyo lacagta. Oo
Yehooyaadaac cimrigiisii oo dhanna guriga Rabbiga waxaa
had iyo goor lagu bixin jiray qurbaanno la gubo. 15 Laakiinse
Yehooyaadaac wuu da' weynaa, gabow buuna la dhacay,
wuuna dhintay, oo markuu dhintay wuxuu jiray boqol iyo
soddon sannadood. 16 Oo waxaa lagu aasay magaaladii
Daa'uud, iyo meel qabuurihii boqorrada dhexdooda ah,
maxaa yeelay, wax wanaagsan buu ku dhex sameeyey
reer binu Israa'iil, iyo xagga Ilaah iyo xagga gurigiisba. 17
Haddaba markii Yehooyaadaac dhintay dabadeed waxaa
yimid amiirradii dalkii Yahuudah oo boqorkay u sujuudeen.
Markaasaa boqorkii iyagii maqlay. 18 Oo iyana waxay ka
tageen gurigii Rabbiga ah Ilaahii awowayaashood, oo waxay
u adeegeen geedihii Asheeraah iyo sanamyadii. Markaasaa
dadkii dalka Yahuudah iyo dadkii Yeruusaalem degganaa
waxaa ku soo degtay cadho xadgudubkoodan aawadiis. 19
Oo weliba wuxuu u soo diray nebiyo si ay iyaga ugu soo
celiyaan Rabbiga xaggiisa, iyana way ku marag fureen iyagii,
laakiin ma ay maqlin. 20 Markaasaa Ruuxii Ilaah wuxuu ku
soo degay Sekaryaah oo uu dhalay wadaadkii Yehooyaadaac
ahaa, oo isna intuu meel dadka ka korraysaa istaagay ayuu
ku yidhi, Ilaah wuxuu idinku leeyahay, War maxaad ugu
xadgudbaysaan Rabbiga amarradiisa? Idinku ma liibaani
karaysaan, maxaa yeelay, Rabbiga waad ka tagteen, isna
wuu idinka tegey. 21 Oo iyana intay isagii shirqool u dhigeen,
ayay iyagoo boqorka amar ka wata isagii ku dhagxiyeen
barxadda guriga Rabbiga. 22 Sidaasuusan Boqor Yoo'aash
u xusuusan roonaantii uu Yehooyaadaac oo isaga aabbihiis
ahaa u sameeyey, laakiinse wuxuu dilay wiilkiisii. Oo markuu
dhimanayay ayuu yidhi, Rabbigu xaalkan ha fiiriyo oo ha
idin weyddiiyo. 23 Oo isla sannaddaas dhammaadkeedii
waxaa isagii ku soo kacay ciidankii reer Suuriya, oo intay
dalkii Yahuudah iyo Yeruusaalem yimaadeen ayay amiirradii
dadka oo dhan ka baabbi'iyeen dadka dhexdiisii, oo wixii ay
dhaceen oo dhan ayay u direen boqorkii Dimishaq degganaa.
24 Ciidankii reer Suuriya waxay yimaadeen iyagoo ah guuto
yar, markaasaa Rabbigu wuxuu gacanta u geliyey ciidan
aad u faro badan, maxaa yeelay, waxay ka tageen Rabbigii
ahaa Ilaahii awowayaashood. Oo sidaasaa xukun loogu
soo dejiyey Yoo'aash. 25 Oo markay isagii ka tageen,

(waayo, waxay ka tageen isagoo aad iyo aad u buka) ayaa
isaga addoommadiisii u sirqooleen dhiiggii uu qabay oo
ilma Yehooyaadaac, kii wadaadka ahaa, oo waxay dileen
isagoo sariirtiisii ku jiifa, wuuna dhintay. Oo waxaa lagu
aasay magaaladii Daa'uud, laakiinse isagii laguma dhex
aasin qabuurihii boqorrada. 26 Oo kuwii isaga sirqoolka
u dhigayna waxay ahaayeen Saabaad oo ay dhashay
Shimcaad oo ahayd reer Cammoon, iyo Yehoosaabaad oo ay
dhashay Shimriid oo ahayd reer Moo'aab. 27 Haddaba xaalkii
wiilashiisa, iyo culaabtii weynayd ee korkiisa saarnayd, iyo
siduu gurigii Ilaah mar dambe u dhisayba, bal eeg waxay
ku wada qoran yihiin kitaabkii boqorrada. Oo meeshiisiina
waxaa boqor ka noqday wiilkiisii Amasyaah.

**25** Oo Amasyaah markuu boqor noqday wuxuu jiray shan
iyo labaatan sannadood, oo Yeruusaalem ayuu boqor
ku ahaa sagaal iyo labaatan sannadood, oo hooyadiis
magaceedana waxaa la odhan jiray Yehoocaddaan tii
reer Yeruusaalem. 2 Oo wuxuu sameeyey wax Rabbiga
hortiisa ku qumman, laakiinse qalbi daacad ah kuma uu
samayn. 3 Oo markii boqortooyadii u xoogaysatay ayuu
laayay addoommadiisii dilay boqorkii aabbihiis ahaa. 4
Laakiinse carruurtoodii ma uu dilin, wuxuuse yeelay sida ku
qoran sharcigii kitaabkii Muuse ku yiil, sidii Rabbigu amray
isagoo leh, Aabbayaashu yaanay u dhiman carruurtooda,
carruurtuna yaanay u dhiman aabbayaashood, laakiinse
nin waluba dembigiisa ha u dhinto. 5 Oo weliba Amasyaah
wuxuu soo wada ururiyey dadkii Yahuudah oo dhan, oo
wuxuu u kala hagaajiyey siday reerahoodu kala ahaayeen,
oo reer Yahuudah iyo reer Benyaamiin oo dhanna wuxuu
taladoodii u dhiibay saraakiil kun kun u taliya iyo kuwa boqor
boqol u taliya, oo weliba wuxuu tiriyey intoodii labaatan
sannadood jirtay ama ka sii weynayd, waxayna ahaayeen
saddex boqol oo kun oo ah rag la doortay, oo dagaalka u
bixi kara, oo wada qaadan kara waran iyo gaashaan. 6
Oo weliba boqol kun oo nin oo ah rag xoog badan ayuu
dalkii Israa'iil kaga soo kiraystay boqol talanti oo lacag
ah. 7 Laakiinse nin Ilaah baa isagii u yimid, oo wuxuu ku
yidhi, Boqorow, ciidanka Israa'iil yaanay ku raacin, maxaa
yeelay, Rabbigu dadka Israa'iil oo reer Efrayim ah oo dhanba
lama uu jiro. 8 Laakiinse haddaad doonayso inaad tagto,
yeel, oo dagaalka ku adkow, Ilaahse wuxuu kugu tuuri
doonaa cadowgaaga hortiisa, maxaa yeelay, Ilaah baa leh
xoog uu wax ku caawiyo iyo mid uu wax ku tuuraba. 9
Markaasaa Amasyaah wuxuu ku yidhi ninkii Ilaah, Haddaba
sidee baannu ka yeelaynaa boqolkii talanti oo aan siiyey
ciidanka Israa'iil? Kolkaasaa ninkii Ilaah u jawaabay oo
ku yidhi, Rabbigu wuu awoodaa inuu ku siiyo wax intaas
ka sii badan. 10 Kolkaasaa Amasyaah soocay ciidankii
isaga dalka reer Efrayim uga yimid, si ay dalkoodii ugu
noqdaan; sidaas daraaddeed aad bay dadkii Yahuudah ugu
cadhoodeen, oo waxay dib ugu noqdeen dalkoodii iyagoo
aad u xanaaqsan. 11 Markaasaa Amasyaah isdhiirrigeliyey,
oo wuxuu hor kacay dadkiisii, oo tegey xagga Dooxadii
Cusbada, oo reer Seciir ayuu ka laayay toban kun oo qof. 12
Oo dadkii Yahuudah toban kun oo kale oo noolnool ayay
soo kaxaysteen oo keeneen Selac dusheedii, markaasay
Selac dusheeda hoos uga tuureen, oo dhammaantoodna
way burbureen. 13 Laakiinse raggii ciidankii ee Amasyaah
dib u diray oo u diiday inay isaga dagaalka u raacaan, waxay
weerar ku dhufteen magaalooyinkii dalka Yahuudah, tan
iyo Samaariya iyo ilaa Beytxooroon, oo waxay ka laayeen
saddex kun oo qof, oo maal badanna way ka dhaceen.
14 Haddaba markii Amasyaah ka soo noqday layntii reer
Edom dabadeed ayuu keensaday ilaahyadii reer Seciir,
oo wuxuu u qotonsaday inay isaga ilaahyo u ahaadaan,
oo iyagii buu u sujuuday oo foox u shiday. 15 Oo sidaas
daraaddeed ayaa Rabbiga cadhadiisii Amasyaah aad ugu
kululaatay, markaasuu nebi u soo diray, kaasoo ku yidhi, War
maxaad u doonatay dadyowga ilaahyadooda, kuwaasoo aan
dadkoodii gacantaada ka samatabbixin? 16 Oo intuu isaga la
hadlayay, ayaa boqorkii ku yidhi, War ma annagaa boqorka
lataliyihiisii kaa dhignay? Bes, bal maxaadse u doonaysaa in
lagu garaaco? Markaasaa nebigii iska daayay oo wuxuu
yidhi, Waxaan ogahay in Ilaah ku talo jiro inuu ku halligo,
maxaa yeelay, waxan baad samaysay, oo taladaydiina ma
aadan maqlin. 17 Markaasaa Amasyaah oo ahaa boqorkii
dalka Yahuudah tashaday, oo wuxuu u cid diray Yoo'aash
oo ahaa ina Yehoo'aaxaas ina Yeehuu oo ahaa boqorkii
dalka Israa'iil, oo wuxuu ku yidhi, Car kaalay aynu iska
hor nimaadnee. 18 Kolkaasaa Yoo'aash oo ahaa boqorkii
dalka Israa'iil u cid diray Amasyaah oo ahaa boqorkii dalka
Yahuudah, oo wuxuu ku yidhi, Yamaaruggii Lubnaan ku yiil
wuxuu u cid diray geedkii kedarka ah oo Lubnaan ku yiil, oo
wuxuu ku yidhi, Gabadhaada sii wiilkaygu ha guursadee, oo
waxaa halkaas soo maray bahal Lubnaan joogay, markaasuu
yamaaruggii ku joogsaday. 19 Waxaad leedahay, Bal eeg,
waxaan laayay reer Edom, oo sidaas daraaddeed waad isla
weynaatay, waadna faanaysaa, haddaba gurigaaga iska
joog. Bal maxaad belaayo isugu soo jiidaysaa oo aad adiga
iyo dadka Yahuudahba u wada dhacaysaan? 20 Laakiinse
Amasyaah taas wuu maqli waayay, maxaa yeelay, waxay
ka timid xagga Ilaah inuu iyaga cadowgooda gacanta u
geliyo, waayo, iyagu waxay doonteen ilaahyadii reer Edom.

21 Markaasuu Yoo'aash oo ahaa boqorkii dalka Israa'iil
soo kacay, oo isagii iyo Amasyaah oo ahaa boqorkii dalka
Yahuudah waxay iskaga hor yimaadeen Beytshemesh oo
uu dadka Yahuudah leeyahay. 22 Oo dadka Israa'iil way
ka adkaadeen dadka Yahuudah, oo nin waluba wuxuu u
cararay teendhadiisii. 23 Oo Yoo'aash oo ahaa boqorkii dalka
Israa'iil ayaa Amasyaah oo ahaa boqorkii dalka Yahuudah,
kaasoo ahaa ina Yoo'aash ina Yehoo'aaxaas, ku qabtay
Beytshemesh, oo intuu Yeruusaalem u soo kaxeeyey ayuu
dumiyey derbigii Yeruusaalem tan iyo iriddii Efrayim iyo
ilaa iriddii geeska ahayd, intaasoo ahayd afar boqol oo
dhudhun. 24 Oo wuxuu qaatay dahabkii iyo lacagtii oo
dhan, iyo weelashii guriga Ilaah laga helay oo Cobeed
Edoom la yiil oo dhan, iyo khasnadiihii guriga boqorka,
oo dadna cudhaadh ahaan buu u kaxaystay, markaasuu
Samaariya ku noqday. 25 Oo Amasyaah ina Yoo'aash oo
ahaa boqorkii dalka Yahuudah wuxuu noolaa shan iyo toban
sannadood oo ka dambaysay dhimashadii Yoo'aash ina
Yehoo'aaxaas oo ahaa boqorkii dalka Israa'iil. 26 Haddaba
Amasyaah falimihiisii kale, kuwii hore iyo kuwii dambeba, sow
kuma qorna kitaabkii boqorradii dalka Yahuudah iyo dalka
Israa'iil? 27 Haddaba Amasyaah markuu gees uga leexday
Rabbiga lasocodkiisii dabadeed shirqool bay Yeruusaalem
ugu sameeyeen, markaasuu Laakiish u cararay, laakiinse
Laakiish bay cid uga daba direen, oo halkaasay ku dileen.
28 Markaasay isagii fardo ku keeneen, oo awowayaashiis
ayaa lagula aasay magaaladii dalka Yahuudah.

26 Markaasaa dadkii Yahuudah oo dhammu waxay soo
kaxaysteen Cusiyaah oo lix iyo toban sannadood jiray,
oo isagay boqor uga dhigeen meeshii aabbihiis Amasyaah.
2 Oo isna Eelood wuu dhisay oo dalka Yahuudah u soo
celiyey markii boqorkii dhintay oo la seexday awowayaashiis
dabadeed. 3 Cusiyaah markuu boqor noqday wuxuu jiray
lix iyo toban sannadood, oo laba iyo konton sannadoodna
Yeruusaalem buu boqor ku ahaa, oo hooyadiis magaceedana
waxaa la odhan jiray Yekaalyaah tii reer Yeruusaalem. 4 Oo
isna wuxuu sameeyey wax Rabbiga hortiisa ku qumman, oo
wuxuu wada yeelay sidii aabbihiis Amasyaah yeelay oo kale.
5 Oo wakhtigii Sekaryaah, oo waxgarasho u lahaa waxa la
arko ee Ilaah, ayuu isu diyaariyey inuu Ilaah doondoonto,
oo intuu Rabbiga doonayayna Ilaah baa isaga liibaaniyey.
6 Markaasuu baxay oo reer Falastiin la dagaallamay, oo
wuxuu dumiyey derbigii Gad, iyo derbigii Yabneh, iyo derbigii
Ashdood, oo wuxuu magaalooyin ka dhisay waddankii reer
Ashdood iyo reer Falastiin dhexdoodaba. 7 Oo Ilaah baa
isaga uga hiiliyey reer Falastiin, iyo kuwii reer Carbeed
ee Guur Bacal degganaa, iyo reer Mecuuniimba. 8 Oo
reer Cammoonna waxay Cusiyaah siin jireen gabbaro, oo
magiciisiina wuxuu ku faafay oo gaadhay xataa meesha
Masar laga galo, maxaa yeelay, aad iyo aad buu u
xoogaystay. 9 Oo weliba Cusiyaah wuxuu Yeruusaalem ka
dhisay oo xoogeeyey munaarado, oo waxay ku yiilleen iriddii
geeska, iyo iriddii dooxada, iyo meesha derbigu ka leexdo. 10
Oo haddana wuxuu munaarado ka dhisay cidlada, oo ceelal
badanna wuu qotay, maxaa yeelay, xoolo badan buu lahaa,
oo waxayna u joogeen dhulka dooxada iyo dhulka bannaanka
ahba, oo buuraha iyo beeraha barwaaqaysanba wuxuu ku
lahaa rag beeraley ah iyo kuwa canabka xannaaneeya,
maxaa yeelay, wuxuu jeclaa beeraha. 11 Oo weliba Cusiyaah
wuxuu lahaa ciidan dagaalyahan ah oo dagaalka koox koox
ugu baxa sidii ay ahayd tiradooda ay sameeyeen Yecii'eel
oo ahaa karraanigii iyo Macaseeyaah oo sirkaalkii ahaa, sidii
uu ku amray Xananyaah oo ahaa boqorka saraakiishiisa
midkood. 12 Oo raggii xoogga badnaa, oo ahaa madaxdii
qolooyinka oo dhan tiradoodu waxay ahayd laba kun iyo
lix boqol oo nin. 13 Oo waxaa gacantooda ku jiray ciidan
ah saddex boqol iyo toddoba kun iyo shan boqol oo nin,
kuwaasoo xoog badan ku dagaallama, si ay boqorka uga
caawiyaan cadowga. 14 Oo Cusiyaah wuxuu ciidankii oo
dhan u diyaariyey gaashaammo iyo warmo, iyo koofiyado
bir ah, iyo jubbado bir ah, iyo qaansooyin, iyo dhagaxyada
la wadhfiyo. 15 Oo Yeruusaalemna wuxuu ku sameeyey
makiinado ay soo hindiseen rag saanacyo ahu, oo alaabtaas
waxaa la saari jiray munaaradaha iyo geesaska derbiyada,
in iyaga laga gano fallaadho iyo dhagxan waaweynba. Oo
weliba magiciisii aad iyo aad buu u sii faafay oo meel fog
gaadhay, maxaa yeelay, ilaa uu xoogaystay si yaab leh
ayaa loo caawiyey. 16 Laakiinse markuu xoogaystay ayuu
isla weynaaday ilaa uu halligmay, oo wuxuu ku xadgudbay
Rabbiga Ilaahiisa ah, waayo, macbudkii Rabbiga ayuu u
galay inuu foox ku shido girgirihii fooxa. 17 Markaasaa waxaa
isagii ka daba galay wadaadkii Casaryaah oo ay la socdaan
siddeetan ah Rabbiga wadaaddadiisa, oo ah rag xoog badan.
18 Markaasay Boqor Cusiyaah hor istaageen, oo waxay ku
yidhaahdeen, Cusiyaahow, adigu ma lihid inaad Rabbiga foox
u shiddid, laakiinse waxaa leh wadaaddada reer Haaruun oo
quduus looga dhigay inay foox shidaan; haddaba meesha
quduuska ah ka bax, waayo, waad xadgudubtay, oo tanuna
kuuma ahaan doonto sharaf Rabbiga Ilaaha ah xaggiisa
kaaga timaada. 19 Markaasaa Cusiyaah cadhooday, oo
gacantana waxaa ugu jiray idan uu doonayay inuu foox ku
shido; oo markuu wadaaddadii u cadhooday ayaa baras
wejiga ka soo baxay, isagoo wadaaddadii hor jooga oo

guriga Rabbiga ku jira oo girgirihii fooxa dhiniciisa taagan.
20 Markaasaa Casaryaah oo ahaa wadaadka sare iyo
wadaaddadii oo dhammu isagay fiiriyeen, oo waxay arkeen
inuu wejigiisa baras ku leeyahay, markaasay haddiiba
halkaas ka saareen, oo isaga qudhiisiina wuu isdedejiyey
inuu baxo, maxaa yeelay, Rabbigaa wax ku dhuftay. 21
Oo Boqor Cusiyaahna tan iyo maalintii uu dhintay wuxuu
ahaa barasle, oo isagoo baras qaba ayuu joogi jiray guri
gaar ah, waayo, wuu ka go'ay gurigii Rabbiga, oo wiilkiisii
Yootam ayaa reerka boqorka u talin jiray, isagoo dadkii
dalka degganaa u gar qaybinaya. 22 Haddaba Cusiyaah
falimihiisii kale, intii hore iyo intii dambeba, waxaa qoray
Nebi Ishacyaah oo ahaa ina Aamoos. 23 Oo Cusiyaah
wuu dhintay oo la seexday awowayaashiis, oo waxaa
awowayaashiis lagula aasay berrinkii xabaalaha oo ay
boqorradu lahaayeen, waayo, waxay isyidhaahdeen, Isagu
waa barasle, oo meeshiisiina waxaa boqor ka noqday wiilkiis
Yootam.

**27** Yootamna markuu boqor noqday wuxuu jiray shan iyo
labaatan sannadood, oo Yeruusaalem ayuu boqor ku
ahaa lix iyo toban sannadood, oo hooyadiis magaceedana
waxaa la odhan jiray Yeruushaah ina Saadooq. 2 Oo isna
wuxuu sameeyey wax Rabbiga hortiisa ku qumman, oo
wuxuu wada yeelay sidii aabbihiis Cusiyaah yeelay oo
kale. Habase yeeshee ma uu gelin macbudkii Rabbiga, oo
dadkiina weliba way sii xumaadeen. 3 Oo isagu wuxuu dhisay
iriddii sare oo guriga Rabbiga, oo derbigii Cofel dushiisana
wax badan buu ka dhisay. 4 Oo haddana wuxuu magaalooyin
ka dhisay dalka Yahuudah oo buuraha leh, oo kaynta
dhexdeedana wuxuu ka dhisay qalcado iyo munaarado. 5
Oo weliba wuxuu la diriray oo ka adkaaday boqorkii reer
Cammoon. Oo reer Cammoonna isla sannaddaasba waxay
isagii siiyeen boqol talanti oo lacag ah, iyo toban kun oo kor
oo sarreen ah, iyo toban kun oo kor oo shaciir ah. Oo reer
Cammoon intaas ayay siiyeen sannaddii labaad iyo sannaddii
saddexaadba. 6 Oo sidaasuu Yootam u xoogaystay, maxaa
yeelay, jidadkiisa ayuu ku hor toosiyey Rabbiga Ilaahiisa ah.
7 Haddaba Yootam falimihiisii kale iyo dagaalladiisii oo dhan
iyo jidadkiisii oo dhammu waxay ku qoran yihiin kitaabkii
boqorrada dalka Israa'iil iyo dalka Yahuudah. 8 Markuu
boqor noqday wuxuu jiray shan iyo labaatan sannadood, oo
Yeruusaalemna lix iyo toban sannadood buu boqor ku ahaa.
9 Markaasaa Yootam dhintay oo la seexday awowayaashiis
oo waxaa lagu aasay magaaladii Daa'uud, oo meeshiisiina
waxaa boqor ka noqday wiilkiisii Aaxaas.

**28** Aaxaas markuu boqor noqday wuxuu jiray labaatan
sannadood, oo lix iyo toban sannadood ayuu
Yeruusaalem boqor ku ahaa, oo isagu ma uu samayn sidii
awowgiis Daa'uud oo kale wax Rabbiga hortiisa ku qumman,
2 laakiinse wuxuu ku socday jidadkii boqorrada dalka Israa'iil,
oo weliba wuxuu Bacaliim u sameeyey sanamyo la shubay.
3 Oo haddana foox buu ku shiday dooxadii ina Hinnom,
oo carruurtiisiina dab buu ku dhex gubay, sidii ay ahayd
karaahiyadii quruumihii Rabbigu ka eryay reer binu Israa'iil
hortooda. 4 Oo haddana wuxuu ku allabaryi jiray oo fooxna
ku shidi jiray meelihii sarsare, iyo buuraha dushooda, iyo
geed kasta oo dheer oo doog ah hoostiisaba. 5 Oo sidaas
daraaddeed ayaa Rabbiga Ilaahiisa ahu isagii ku riday
gacantii boqorkii Suuriya, oo intay isagii wax ku dhufteen ayay
dadkiisii tirada badnaana maxaabiis ahaan ugu kaxaysteen
Dimishaq. Oo haddana isagii waxaa gacanta loo geliyey
boqorkii dalka Israa'iil kaasoo wax badan ka laayay. 6 Oo
Feqax ina Remalyaah ayaa dalka Yahuudah isku maalin ku
laayay boqol iyo labaatan kun oo nin oo dhammaantood
wada xoog badan, maxaa yeelay, iyagu waxay ka tageen
Rabbigii ahaa Ilaahii awowayaashood. 7 Oo Sikrii oo ahaa
nin xoog badan oo reer Efrayim ayaa dilay Macaseeyaah
oo ahaa boqorka wiilkiisii, iyo Casriiqaam oo reerka u
talin jiray, iyo Elqaanaah oo ahaa kii boqorka ku xigay. 8
Oo dadkii Israa'iilna waxay walaalahood maxaabiis ahaan
uga soo kaxaysteen laba boqol oo kun oo qof, oo ahaa
naago iyo wiilal iyo gabdhoba, oo waxay kaloo ka dhaceen
maal badan, oo maalkiina waxay keeneen Samaariya. 9
Laakiinse halkaas waxaa joogay nebi Rabbigu soo dirtay, oo
magiciisana waxaa la odhan jiray Codeed, wuuna u baxay
inuu ka hor tago ciidankii Samaariya ku soo socday oo
wuxuu ku yidhi, Bal eega, Rabbiga ah Ilaahii awowayaashiin
ayaa u cadhooday dadka Yahuudah, oo sidaas daraaddeed
ayuu iyaga gacantiinna u soo geliyey, oo idinna waxaad iyagii
ku layseen cadho kulul oo tan iyo samada gaadhay. 10 Oo
imminka waxaad ku talo jirtaan inaad hoosaysiisaan dadka
Yahuudah iyo dadka Yeruusaalem si ay idiinku ahaadaan
niman addoommo ah iyo naago addoommo ah, laakiinse
miyaanay jirin xadgudubyo aad idinkuba ku xadgudubteen
Rabbiga Ilaahiinna ah? 11 Haddaba i maqla, oo celiya
maxaabiistii aad walaalihiin ka soo kaxaysateen, maxaa
yeelay, waxaa idin kor saaran Rabbiga cadhadiisa kulul. 12
Markaasay madaxdii reer Efrayim qaarkood hor istaageen
kuwii dagaalka ka soo noqday, oo madaxdaasuna waxay
ahaayeen Casaryaah ina Yooxaanaan, iyo Berekyaah ina
Meshilleemood, iyo Yexisqiyaah ina Shalluum, iyo Camaasaa
ina Xadlay. 13 Oo waxay iyagii ku yidhaahdeen, Idinku waa

inaydnaan maxaabiista halkan soo gelin, waayo, waxaad ku
talo jirtaan inaad ina kor saartaan xadgudub Rabbiga ka
gees ah, oo waxaad inoo sii kordhinaysaan dembiyadeennii
iyo xadgudubkeennii, maxaa yeelay, xadgudubkeennu aad
buu u weyn yahay, oo dadka Israa'iilna aad baa loogu
cadhooday. **14** Sidaas daraaddeed raggii hubka sitay waxay
maxaabiistii iyo boolidiiba kaga tageen amiirrada iyo shirkii oo
dhan hortooda. **15** Markaasay nimankii la magacaabay soo
kaceen, oo waxay qabteen maxaabiistii, oo kuwii dhexdooda
ku jiray oo qaawanaana dhar bay uga xidheen boolidii, wax
bay huwiyeen, oo kabana way u geliyeen, oo waxay siiyeen
wax ay cunaan iyo wax ay cabbaanba, wayna u subkeen,
oo kuwii itaalka yaraa oo dhanna dameeray ku qaadeen,
markaasay Yerixoo oo ahayd magaaladii geedatimireedka
lahayd walaalahood ugu geeyeen, dabadeedna Samaariya
ayay ku noqdeen. **16** Oo wakhtigaas ayaa Boqor Aaxaas
u cid dirsaday boqorradii reer Ashuur inay caawiyaan. **17**
Waayo, waxaa haddana yimid reer Edom oo intay dalka
Yahuudah wax ku dhufteen ayay dadkoodii maxaabiis
ahaan u kaxaysteen. **18** Oo weliba reer Falastiinna waxay
weerareen magaalooyinkii dooxada iyo kuwii dalka Yahuudah
ee Koonfureed, oo waxay qabsadeen Beytshemesh, iyo
Ayaaloon, iyo Gedeerood, iyo Sookoo iyo tuulooyinkeedii,
iyo Timnaah iyo tuulooyinkeedii, iyo weliba Gimsoo iyo
tuulooyinkeedii, oo intaas oo dhanna way iska degeen. **19**
Rabbigu wuxuu dadka Yahuudah hoos ugu dejiyey boqorkii
dalka Israa'iil oo Aaxaas ahaa daraaddiis, maxaa yeelay,
si xun buu dalka Yahuudah ugu dhex macaamilooday, oo
Rabbigana aad buu ugu xadgudbay. **20** Markaasaa waxaa
isagii u yimid Tilgad Filneser oo ahaa boqorkii Ashuur,
oo isna aad buu u dhibay, mana uu caawin isagii. **21**
Markaasaa Aaxaas qayb ka soo qaaday gurigii Rabbiga
iyo gurigii boqorka iyo kii amiirradaba, oo wuxuu siiyey
boqorkii Ashuur, laakiinse taasu isagii waxba uma tarin. **22**
Oo Boqor Aaxaas kaas qudhiisu intuu dhibaataysnaa ayuu
weliba Rabbiga si weyn ugu sii xadgudbay. **23** Waayo, isagu
wuxuu allabari u bixiyey ilaahyadii Dimishaq oo isaga wax ku
dhuftay, oo wuxuu isyidhi, Ilaahyada boqorrada reer Suuriya
way caawiyaan iyaga, sidaas daraaddeed allabari ayaan
u bixinayaa si ay anigana ii caawiyaan. Laakiinse waxay
isaga iyo reer binu Israa'iil oo dhanba u noqdeen wax ay ku
dhacaan. **24** Markaasaa Aaxaas wuxuu soo wada urursaday
weelashii guriga Ilaah oo wuu wada burburiyey weelashii
guriga Ilaah, oo albaabbadii guriga Rabbigana wuu wada
xidhay, oo isna wuxuu meelo allabari ka samaystay gees
kasta oo Yeruusaalem. **25** Oo magaaloo kasta oo dalka
Yahuudahna wuxuu ka dhisay meelo sarsare in foox loogu
shido ilaahyo qalaad, oo wuxuu aad uga xanaajiyey Rabbigii
ahaa Ilaahii awowayaashiis. **26** Haddaba falimihiisii kale iyo
jidadkiisii oo dhammu intii hore iyo intii dambeba waxay
ku wada qoran yihiin kitaabkii boqorrada dalka Yahuudah
iyo dalka Israa'iil. **27** Markaasaa Aaxaas dhintay oo la
seexday awowayaashiis, oo waxaa lagu aasay magaalada
Yeruusaalem, waayo, isagii lama gelin qabuurihii boqorrada
dalka Israa'iil; oo meeshiisiina waxaa boqor ka noqday
wiilkiisii Xisqiyaah.

**29** Xisqiyaah markuu boqor noqday wuxuu jiray shan
iyo labaatan sannadood, oo Yeruusaalemna boqor
buu ku ahaa sagaal iyo labaatan sannadood, oo hooyadiis
magaceedana waxaa la odhan jiray Abiiyaah ina Sekaryaah.
**2** Oo isna wuxuu sameeyey wax Rabbiga hortiisa ku qumman,
sidii dhammaan awowgiis Daa'uud sameeyey oo kale. **3** Oo
sannaddii kowaad oo boqornimadiisa bisheedii kowaad ayuu
albaabbadii gurigii Rabbiga furay, wuuna cusboonaysiiyey. **4**
Oo wadaaddadii iyo kuwii reer Laawina wuu soo geliyey,
oo wuxuu iyagii ku soo wada urursahay meesha bannaan
oo dhinaca bari ku taal. **5** Oo wuxuu iyagii ku yidhi, Reer
Laawiyow, i maqla, oo haddeer isdaahiriya, oo waxaad
kaloo daahirisaan guriga Rabbiga ah Ilaahii awowayaashiin,
oo nijaastana ka bixiya meesha quduuska ah. **6** Waayo,
awowayaasheen way xadgudbeen, oo waxay sameeyeen
wax shar ah Rabbiga Ilaaheenna ah hortiisa, oo isagii
way ka tageen, oo wejigoodiina way ka sii jeediyeen rugtii
Rabbiga, oo waxay u jeediyeen dhabarkooda. **7** Oo weliba
waxay xidheen albaabbadii balbalada, oo laambadihiina way
demiyeen, oo Ilaaha reer binu Israa'iilna meeshii quduuska
ahayd foox uguma ay shidin, oo qurbaanno la gubona uguma
ay bixin. **8** Oo taas daraaddeed ayaa cadhada Rabbigu
ugu soo degtay dadka Yahuudah iyo Yeruusaalemba, oo
Rabbiguna wuxuu iyagii geliyey rabshad iyo in laga yaabo
oo lagu foodhyo, sida aad idinkuba indhihiinna ugu aragtaan.
**9** Waayo, bal eega, awowayaasheen seef bay ku le'deen,
oo wiilasheennii iyo gabdhaheennii iyo dumarkeenniiba
waxaa loo haystaa maxaabiis, waana taas daraaddeed. **10**
Haddaba waxaa qalbigayga ku jirta inaan axdi la dhigto
Rabbiga ah Ilaaha reer binu Israa'iil, si ay cadhadiisa kululu
inooga noqoto. **11** Wiilashaydiiyow, haddaba adeegiddiinna
ha dayacina, maxaa yeelay, Rabbigu wuxuu idiin doortay
inaad hortiisa istaagtaan oo aad isaga u adeegtaan, oo
aad midiidinno u ahaataan, oo aad foox u shiddaan. **12**
Markaasaa kuwii reer Laawi waxaa ka dhex kacay Maxad ina
Camaasay, iyo Yoo'eel ina Casaryaah oo ahaa reer Qohaad,
oo reer Meraariina waxaa ka kacay Qiish ina Cabdii, iyo
Casaryaah ina Yehaleleel, oo reer Gershoonna waxaa ka

kacay Yoo'aax ina Simmaah, iyo Ceeden ina Yoo'aax. 13 Oo
reer Eliisaafaanna waxaa ka kacay Shimrii iyo Yecuu'eel, oo
reer Aasaafna waxaa ka kacay Sekaryaah iyo Matanyaah.
14 Oo reer Heemaanna waxaa ka kacay Yexii'eel iyo Shimcii,
oo reer Yeduutuunna waxaa ka kacay Shemacyaah iyo
Cusii'eel. 15 Oo waxay soo wada ururiyeen walaalahood,
oo intay isdaahiriyeen ayay guriga Rabbiga u galeen inay
nadiifiyaan si waafaqsan amarkii boqorka ee ahaa erayadii
Rabbiga. 16 Oo wadaaddadiina waxay galeen meeshii guriga
Rabbiga ugu hoosaysay inay nadiifiyaan, oo wasakhdii ay
macbudka Rabbiga gudihiisa ka heleen oo dhan waxay isugu
wada keeneen barxaddii guriga Rabbiga. Markaasaa kuwii
reer Laawi qaadeen oo waxay geeyeen durdurka Qidroon. 17
Haddaba iyagu waxay isdaahirinta bilaabeen bishii kowaad
maalinteedii kowaad, oo isla bishaas maalinteedii siddeedaad
ayay yimaadeen balbaladii Rabbiga, oo guriga Rabbigana
waxay ku daahiriyeen siddeed maalmood, oo hawshaas
waxay dhammeeyeen bishii kowaad maalinteedii lix iyo
tobnaad. 18 Markaasay Boqor Xisqiyaah ugu galeen gurigiisii
boqornimada oo waxay ku yidhaahdeen, Waannu wada
nadiifinnay gurigii Rabbiga oo dhan, iyo meeshii qurbaanka la
gubo, iyo weelasheedii oo dhan, iyo miiskii la saari jiray kibistii
tusniinta iyo weelashiisii oo dhanba. 19 Oo weliba Boqor
Aaxaas intuu boqor ahaa weelashii uu xoorxooray markuu
xadgudbay dhammaantood waannu wada diyaarinnay oo
waannu daahirinnay, oo bal eeg, waxay hor yaalliin meesha
allabariga ee Rabbiga. 20 Markaasaa Boqor Xisqiyaah
wakhti hore kacay oo intuu soo wada urursaday amiirradii
magaalada ayuu kor ugu baxay gurigii Rabbiga. 21 Oo
waxay keeneen toddoba dibi, iyo toddoba wan, iyo toddoba
baraar ah, iyo toddoba orgi, inay qurbaan dembi u ahaadaan
boqortooyada aawadeed iyo meesha quduuska ah aawadeed
iyo dadka Yahuudah aawadood. Oo wuxuu wadaaddadii
reer Haaruun ku amray inay xoolahaas ku bixiyaan meesha
Rabbiga lagu baryo. 22 Markaasay dibidii gowraceen oo
intay wadaaddadii dhiiggii soo qaadeen ayay meesha
allabariga ku rusheeyeen, oo haddana waxay gowraceen
wanankii, oo dhiiggoodiina way ku rusheeyeen meesha
allabariga, baraarkiina way gowraceen, oo dhiiggoodiina
meesha allabariga ayay ku rusheeyeen. 23 Oo orgidii
qurbaanka dembiga ahaydna boqorkii iyo shirkii hortooda
ayay u soo dhoweeyeen, oo gacmahoodii ayay korka ka
saareen, 24 markaasaa wadaaddadii orgidii gowraceen oo
waxay dhiiggoodii dembi qurbaankiis kaga dhigeen meesha
allabariga korkeeda si ay dadka Israa'iil oo dhan kafaaraggud
ugu sameeyaan aawadeed, waayo, boqorka ayaa amray
in qurbaanka la gubo iyo qurbaanka dembigaba loo wada
sameeyo dadka Israa'iil oo dhan. 25 Oo kuwii reer Laawina
wuxuu soo taagay gurigii Rabbiga gudihiisa iyagoo haysta
suxuun laysku garaaco iyo shareerado iyo kataarado, siduu
ahaa amarkii Daa'uud iyo amarkii Gaad oo ahaa waxarkihii
boqorka, iyo amarkii Nebi Naataan, waayo, amarku wuxuu
ka yimid Rabbiga xaggiisa, oo nebiyadiisii buu u soo dhiibay.
26 Markaasaa reer Laawi waxay istaageen iyagoo haysta
alaabtii muusikada oo Daa'uud, oo wadaaddadiina waxay
istaageen iyagoo haysta turumbooyin. 27 Xisqiyaahna wuxuu
amray in qurbaanka la gubo meesha allabariga lagu dul
bixiyo. Oo markii qurbaanka la gubo bixintiisa la bilaabay
waxaa kaloo la bilaabay gabaygii ahaa ammaanta Rabbiga,
iyo turumbooyinkii, iyo alaabtii muusikada oo Daa'uud oo
ahaa boqorkii dalka Israa'iil. 28 Oo shirkii oo dhammuna
Ilaah bay caabudeen, oo raggii gabayaaga ahaana way
gabyeen, oo kuwii turumbada watayna way ka dhawaajiyeen;
oo waxaas oo dhammuna way sii socdeen tan iyo ilaa
qurbaankii la gubayay ka dhammaaday. 29 Oo markay
dhammeeyeen qurbaanka bixintiisii ayaa boqorkii iyo kuwii
isaga la joogay oo dhammu wada fooroorsadeen oo Ilaah
caabudeen. 30 Oo weliba Boqor Xisqiyaah iyo amiirradii ayaa
reer Laawi ku amreen inay Rabbiga ammaan ugu gabyaan
erayadii Daa'uud iyo kuwii Aasaaf kii wax arkaha ahaa.
Oo waxay ammaan ku gabyeen iyagoo faraxsan, oo intay
madaxa foororiyeen ayay Ilaah caabudeen. 31 Markaasaa
Xisqiyaah jawaabay oo yidhi, Hadda idinku waxaad quduus
isaga dhigteen Rabbiga, haddaba soo dhowaada oo guriga
Rabbiga waxaad soo gelisaan allabaryo iyo qurbaanno
mahadnaqid ah. Kolkaasaa shirkii soo gesheen allabaryo
iyo qurbaanno mahadnaqid ah, oo in alla intii qalbigoodu
raalli ahaana waxay keeneen qurbaanno la gubo. 32 Oo
qurbaannadii la gubayay oo shirku keenayna tiradoodu
waxay ahayd toddobaatan dibi, iyo boqol wan, iyo laba boqol
oo baraar ah, oo intaasoo dhanna waxaa Rabbiga loogu
keenay qurbaanno la gubo. 33 Oo xoolihii la daahiriyeyna
waxay ahaayeen lix boqol oo dibi iyo saddex kun oo ido
ah. 34 Laakiinse wadaaddadu aad bay u yaraayeen oo
ma ay wada qali karin qurbaannadii la gubayay oo dhan,
sidaas daraaddeed waxaa iyagii caawiyey walaalahoodii reer
Laawi ilaa uu shuqulkii dhammaaday oo ay wadaaddadiina
isdaahiriyeen, waayo, reer Laawi way ka qalbi toosnaayeen
wadaaddada inay isdaahiriyaan. 35 Oo weliba qurbaannadii
la gubayay iyo baruurtii qurbaannadii nabaadiinada, iyo
qurbaannadii cabniinka oo la socday qurbaan kastoo la
guboba aad bay u badnaayeen. Sidaasay hawshii guriga
Rabbiga loo hagaajiyey. 36 Oo Xisqiyaah iyo dadkii oo
dhammuba aad bay ugu reyreeyeen wixii Ilaah dadka

u diyaariyey aawadood, waayo, xaalkaas waxaa lagu
sameeyey si kedis ah.

**30** Markaasaa Xisqiyaah u cid diray dadka Israa'iil oo dhan
iyo dadka Yahuudah, oo haddana wuxuu warqado u
qoray reer Efrayim iyo reer Manaseh, inay dhammaantood
wada yimaadaan guriga Rabbiga oo Yeruusaalem ku yaal, si
ay Iiddii Kormaridda ugu sameeyaan Rabbiga ah Ilaaha reer
binu Israa'iil. 2 Waayo, boqorka, iyo amiirradiisii, iyo shirkii
Yeruusaalem joogay oo dhammu waxay ku arrinsadeen
inay Iiddii Kormaridda sameeyaan bishii labaad. 3 Maxaa
yeelay, iyagu wakhtigaas ma ay samayn karin, waayo,
wadaaddadii tiro hawsha ku filanu isma ay daahirin, oo
dadkiina Yeruusaalem kuma ay soo wada ururin. 4 Oo
waxaasuna wuu la qummanaa boqorkii iyo shirkii oo dhanba.
5 Sidaas daraaddeed waxay amar ku soo saareen in lagu
naadiyo dalka reer binu Israa'iil oo dhan, tan iyo Bi'ir Shebac
iyo ilaa Daan, inay wada yimaadaan oo ay Rabbiga ah
Ilaaha reer binu Israa'iil Iidda Kormaridda Yeruusaalem
ugu sameeyaan, waayo, wakhti dheer looma samayn sida
qoran. 6 Sidaas daraaddeed niman wargeeys ah ayaa
boqorkii iyo amiirradiisii ka qaadeen warqadihii, waxayna
dhex marsiiyeen dalka Israa'iil iyo dalka Yahuudah oo dhan,
waxayna ku socdeen si waafaqsan boqorka amarkiisii, iyagoo
leh, Reer binu Israa'iilow, mar kale ku soo noqda Rabbiga ah
Ilaaha Ibraahim iyo Isxaaq iyo Israa'iil, inuu isagu ku soo
jeedsado kuwiinna ka baxsaday gacantii boqorradii Ashuur.
7 Oo idinku ha noqonina sidii awowayaashiin oo kale, iyo
sidii walaalihiin oo kale, kuwaasoo ku xadgudbay Rabbiga
ah Ilaahii awowayaashood, oo uu isna taas aawadeed iyagii
ka dhigay wax laga yaabo, sida aad idinkuba u aragtaan.
8 Haddaba sidii awowayaashiin ahaan jireen, idinkuna ha
noqonina dad madax adag, laakiinse idinku Rabbiga isu
dhiiba, oo gala meeshiisa quduuska ah oo uu weligiisba
quduus ka dhigay, oo u adeega Rabbiga Ilaahiinna ah,
si cadhadiisa kululi ay idiinka noqoto. 9 Waayo, haddaad
Rabbiga u soo noqotaan, walaalihiin iyo carruurtiinniiba
waxay naxariis ka heli doonaan kuwii iyaga maxaabiis
ahaanta u kaxaystay, oo iyana mar kalay dalkan ku soo
noqon doonaan, maxaa yeelay, Rabbiga Ilaahiinna ahu
waa roonaan badan yahay, waana naxariis miidhan, oo
wejigiisana idinka sii jeedin maayo haddaad isaga u soo
noqotaan. 10 Sidaas daraaddeed nimankii wargeeyska
ahaa magaaloba magaalay u sii dhex mareen dalkii reer
Efrayim iyo kii reer Manaseh oo dhan, iyo xataa ilaa kii
reer Sebulun, laakiinse iyaga waa lagu qoslay, waana lagu
majaajilooday. 11 Habase yeeshee qaar ah reer Aasheer
iyo reer Manaseh iyo reer Sebulun ayaa is-hoosaysiiyey
oo Yeruusaalem yimid. 12 Oo weliba dadka Yahuudahna
waxaa la jirtay Rabbiga gacantiisii inay isku qalbi ahaadaan
oo ay sameeyaan amarkii boqorka iyo kii amiirradiisa oo
ahaa Eraygii Rabbiga. 13 Haddaba bishii labaad waxaa
Yeruusaalem ku soo shiray oo Iiddii Kibista-aan-khamiirka-
lahayn sameeyey dad badan oo ah shir aad iyo aad u weyn.
14 Markaasay kaceen oo waxay fogeeyeen meelihii allabariga
oo Yeruusaalem dhex yiil iyo girgirayaashii fooxa lagu shidi
jiray oo dhan, oo dhammaantood waxay ku dhex tuureen
durdurkii Qidroon. 15 Markaasay neefafkii Iiddii Kormaridda
qaleen bishii labaad maalinteedii afar iyo tobnaad, oo
wadaaddadii iyo kuwii reer Laawina way yaxyaxeen, oo
intay isdaahiriyeen ayay qurbaanno la gubo keeneen gurigii
Rabbiga. 16 Markaasay meeshoodii istaageen sidii loogu
amray sharcigii Muuse oo ahaa ninkii Ilaah, oo wadaaddadu
waxay saydhsaydhi jireen dhiiggii ay ka guddoomeen gacantii
reer Laawi. 17 Oo waxaa jiray kuwo badan oo shirka
ka mid ahaa oo aan isdaahirin, sidaas daraaddeed reer
Laawi shuqulkoodu wuxuu ahaa inay neefafka Kormaridda
u gowracaan mid alla midkii aan nadiif ahayn, si ay iyaga
Rabbiga ugu daahiriyaan. 18 Maxaa yeelay, dad badan,
xataa kuwa badan oo ahaa reer Efrayim iyo reer Manaseh
iyo reer Isaakaar iyo reer Sebulun ayan isnadiifin oo weliba
waxay wax uga cuneen neefafka Kormaridda si ka duwan
sidii qornayd. Waayo, Xisqiyaah ayaa iyaga u duceeyey
oo yidhi, Rabbiga wanaagsanu ha cafiyo ku alla kii 19
qalbigiisa u diyaariya inuu doondoono Ilaaha ah Rabbiga
oo ah Ilaahii awowayaashiis in kastoo uusan isu nadiifin
sidii ay ahayd isdaahirintii meesha quduuska ah. 20 Oo
Rabbiguna wuu maqlay Xisqiyaah, dadkiina wuu bogsiiyey.
21 Oo reer binu Israa'iil ee Yeruusaalem joogayna intii
toddoba maalmood ah ayay iidayeen Iiddii Kibista-aan-
khamiirka-lahayn, iyagoo aad u faraxsan, oo kuwii reer Laawi
iyo wadaaddadiina maalin kasta ayay Rabbiga ammaani
jireen, iyagoo Rabbiga ugu gabyaya alaab muusiko oo
dhawaaq dheer. 22 Oo Xisqiyaahna wuxuu dhiirrigeliyey
kuwii reer Laawi oo hawsha Rabbiga aad u yiqiin. Oo
toddobadii maalmood ee iiddu socotayba wax bay cunayeen,
iyagoo qurbaanno nabaadiino bixinaya, oo Rabbiga ah
Ilaahii awowayaashood u mahadnaqaya. 23 Oo shirkii oo
dhammuna waxay ku tashadeen inay toddoba maalmood
oo kale sii iidaan, oo haddana toddoba maalmood oo kale
ayay sii iidayeen iyagoo faraxsan. 24 Waayo, Xisqiyaah oo
ahaa boqorkii dalka Yahuudah wuxuu shirkii u siiyey inay
qurbaan ka dhigtaan kun dibi iyo toddoba kun oo ido ah, oo
amiirradiina waxay shirkii siiyeen kun dibi iyo toban kun oo

ido ah, oo wadaaddo tiro badanuna way isdaahiriyeen. **25** Oo
shirkii dadkii Yahuudah oo dhan iyo wadaaddadii iyo kuwii
reer Laawi, iyo shirkii dalka Israa'iil ka yimid oo dhan, iyo
shisheeyayaashii dalka Israa'iil ka yimid oo dalka Yahuudah
degganaaba way wada reyreeyeen. **26** Oo Yeruusaalem
waxaa jirtay farxad weyn, waayo, taasoo kale kama ay dhicin
Yeruusaalem tan iyo wakhtigii Sulaymaan ina Daa'uud uu
boqor dalka Israa'iil ka ahaa. **27** Markaasaa wadaaddadii reer
Laawi ahaa kaceen oo dadkii u duceeyeen, oo codkoodiina
waa la maqlay, oo baryootankoodii wuxuu soo gaadhay
samada ee ah Rabbiga rugtiisa quduuska ah.

**31** Haddaba markii waxyaalahaasu wada dhammaadeen
ayaa reer binu Israa'iilkii joogay oo dhammu tegey
magaalooyinkii dalka Yahuudah, oo waxay burburiyeen
tiirarkii, geedihii Asheeraahna way jareen, oo meelihii sarsare
iyo meelihii allabarigaba way ka dundumiyeen kulli dalkii reer
Yahuudah iyo reer Benyaamiin iyo reer Efrayim iyo xataa kii
reer Manasehba, ilaa ay wada baabbi'iyeen dhammaantood.
Markaasaa reer binu Israa'iil oo dhammu wada noqdeen oo
nin kastaaba wuxuu ku laabtay hantidiisii, waxayna galeen
magaalooyinkoodii. **2** Oo Xisqiyaahna kooxihii wadaaddada
iyo kuwii reer Laawiba wuxuu u doortay siday nin walba
adeegiddiisu ahayd, oo wadaaddadii iyo kuwii reer Laawiba
nin kastaba hawshiisii buu amray inay bixiyaan qurbaanno
la gubo iyo qurbaanno nabaadiinada, iyo inay adeegaan,
oo ay mahadnaqaan, oo ay Ilaah ku ammaanaan xerada
Rabbiga irdaheeda. **3** Oo wuxuu kaloo amray qaybtii boqorka
maalkiisa kaga bixi lahayd qurbaannada la gubo, kuwaasoo
ah qurbaannada la gubi lahaa subaxda iyo fiidka, iyo
qurbaannada la gubi lahaa sabtiyada, iyo kuwii la gubi lahaa
markay bilaha cusubu dhashaan iyo kuwii iidaha joogtada
ah siday ugu qoran tahay sharciga Rabbiga. **4** Oo weliba
dadkii Yeruusaalem degganaana wuxuu ku amray inay
wadaaddada iyo kuwa reer Laawiba siiyaan qaybtoodii, si
ay ugu xoogaystaan sharciga Rabbiga. **5** Oo haddiiba mar
alla markii amarkii soo baxay ayaa dadkii Israa'iil bixiyeen
wax faro badan oo ah midhihii dhulka ugu horreeyey, oo ah
hadhuudh, iyo khamri, iyo saliid, iyo malab, iyo wixii dhulka
ka baxay oo dhan, oo wax kasta toban meelood meel ayay
si badan u keeneen. **6** Oo dadkii Israa'iil iyo dadkii Yahuudah
oo degganaa magaalooyinkii dalka Yahuudah, iyaguna
waxay toban meelood meel ka keeneen lo'da iyo idaha, iyo
weliba alaabtii la soocay oo quduuska looga dhigay Rabbiga
Ilaahooda ah, wayna iskor tuuleen. **7** Oo tuulmooyinka
aasaaskoodii waxay bilaabeen bishii saddexaad, waxayna
iyaga dhammeeyeen bishii toddobaad. **8** Oo Xisqiyaah iyo
amiirradiiba markay yimaadeen oo arkeen tuulmooyinkii,
ayay Rabbiga ku mahadnaqeen, dadkiisii reer binu Israa'iilna
way u duceeyeen. **9** Markaasaa Xisqiyaah wadaaddadii
iyo kuwii reer Laawi wax ka weyddiiyey tuulmooyinkii.
**10** Oo Casaryaah oo ahaa wadaadkii sare oo ahaa reer
Saadooq ayaa u jawaabay oo ku yidhi, Tan iyo markii
dadku bilaabay inay qurbaannadii keenaan guriga Rabbiga,
waannu cunnay oo dheregnay, oo waxaa naga hadhay
wax faro badan, waayo, Rabbigu dadkiisuu barakeeyey, oo
wixii hadhayna waa waxan badan. **11** Markaasaa Xisqiyaah
amray in guriga Rabbiga qolal laga diyaariyo, waana la
diyaariyey. **12** Oo si aaminnimo ah ayaa loo soo keenay
qurbaannadii, iyo meeltobnaadyadii, iyo alaabtii quduuska
laga dhigay, oo waxaa iyaga u talin jiray Kaananyaah oo
ahaa reer Laawi, oo walaalkiis Shimciina wuxuu ahaa kan
labaad. **13** Oo Yexii'eel, iyo Casasyaah, iyo Nahad, iyo
Casaaheel, iyo Yeriimood, iyo Yoosaabaad, iyo Elii'eel, iyo
Yismakyaah, iyo Maxad, iyo Benaayaahna waxay ahaayeen
kuwii wax u talin jiray oo ka hooseeyey Kaananyaah iyo
walaalkiis Shimcii, oo waxaa doortay Boqor Xisqiyaah iyo
Casaryaah oo ahaa taliyihii guriga Ilaah. **14** Oo Qore ina
Yimnaah oo ahaa reer Laawi, oo ahaa iridjoogihii joogay
iridda bari, isna wuxuu u talin jiray qurbaannada ikhtiyaarka
loogu bixiyo Ilaah inuu qaybiyo qurbaannada Rabbiga iyo
waxyaalaha ugu wada quduusan. **15** Oo isagana waxaa
ka hooseeyey Ceeden, iyo Minyaamin, iyo Yeeshuuca,
iyo Shemacyaah, iyo Amaryaah, iyo Shekaanyaah, oo
joogay magaalooyinkii wadaaddada iyagoo kala haysta
jagooyinkoodii lagu aaminay, inay walaalahood qayb u kala
siiyaan siday kooxahoodu ahaayeen, kan ugu weyn iyo kan
ugu yaru ayan waxba isdheeraysan, **16** oo weliba waxaa
qayb la siiyey kuwii lagu tiriyey abtiriskii laboodka, intii
saddex sannadood jirtay ama ka sii weynaydba, iyo xataa
mid kasta oo guriga Rabbiga sidii maalin kasta hawsheeda
loo doonayay u geli jiray adeegidda loo amray iyaga sidii
kooxahoodii ay kala ahaayeen, **17** oo waxaa qayb la siiyey
kuwii abtiriskooda lagu tiriyey reerihii wadaaddada ahaa,
iyo kuwii reer Laawi oo jiray labaatan sannadood ama ka
sii weynaa sidii shuqulkooda loo amray iyo kooxahoodii
ay kala ahaayeen, **18** iyo weliba kuwii abtiriskooda lagu
tiriyey oo ahaa dhallaankoodii yaryaraa, iyo naagahoodii,
iyo wiilashoodii, iyo gabdhahoodiiba oo shirka oo dhan
ku dhex jiray, waayo, iyagu jagadoodii lagu aaminay ayay
quduus iskaga dhigeen. **19** Oo weliba wadaaddadii ahaa
farcanka Haaruun oo joogay beeraha magaalooyinkooda
agagaarkoodii, magaalo kasta waxaa ugu jiray niman loo
magacaabay inay qayb siiyaan wadaaddada inta lab ku jira

oo dhan iyo kuwii reer Laawi oo abtiriskooda lagu tiriyey
oo dhan. 20 Oo Xisqiyaah sidaasuu ku dhex yeelay dalkii
Yahuudah oo dhan, oo wuxuu sameeyey wax wanaagsan oo
ku qumman, daacadna ku ah Rabbiga Ilaahiisa ah hortiisa.
21 Oo shuqul kasta oo uu ku bilaabay hawshii gurigii Rabbiga,
iyo sharciga, iyo amarrada, si uu u doondoono Ilaahiisa,
wuxuu ku samayn jiray qalbigiisa oo dhan, wuuna ku liibaani
jiray.

**32** Oo waxyaalahaas iyo aaminnimadaas dabadood waxaa
yimid oo dalka Yahuudah soo galay Seenxeeriib oo
ahaa boqorkii Ashuur; magaalooyinkii deyrka lahaana ayuu
weeraray, wuuna ku talo jiray inuu iyaga qaato. 2 Xisqiyaahna
markuu arkay in Seenxeeriib yimid oo uu ku talo jiro inuu
Yeruusaalem la diriro, 3 ayuu amiirradiisii iyo raggiisii xoogga
badnaa kula tashaday in la wada awdo ilaha biyaha ah oo
magaalada dibaddeeda ku yaal, oo iyana way caawiyeen.
4 Sidaas aawadeed waxaa isu soo ururay dad badan,
wayna wada awdeen ilihii biyaha ahaa oo dhan iyo durdurkii
waddanka dhex mari jiray, oo waxay isyidhaahdeen, Bal
boqorrada dalka Ashuur intay yimaadaan maxay biyo badan
u helayaan? 5 Markaasuu isdhiirrigeliyey, oo dhisay derbigii
dunsanaa oo dhan, oo kor u gaadhsiiyey tan iyo munaaradihii,
wuxuuna dhisay derbi kaloo dibadda ah, oo xoogeeyey Millo
oo ku dhex tiil magaaladii Daa'uud, oo sameeyey hub dagaal
iyo gaashaammo faro badan. 6 Oo taladii dadkana wuu u
dhiibay saraakiil dagaalka yaqaan, oo dhammaantoodna
wuxuu ku soo wada urursaday meeshii bannaanayd oo
magaalada iriddeeda u dhowayd, wuuna dhiirrigeliyey oo ku
yidhi, 7 Xoog yeesha oo aad u dhiirranaada, ha ka cabsanina,
hana ka qalbi jabina boqorka Ashuur ama ciidanka faraha
badan oo isaga la socda, maxaa yeelay, waxaa inala jira
kuwa ka badan kuwa isaga la jira. 8 Isaga waxaa la jira
binu-aadmi, laakiinse innaga waxaa inala jira oo ina caawiya
oo dagaalladeenna inoo dirira Rabbiga Ilaaheenna ah. Oo
dadkiina waxay isku halleeyeen erayadii Xisqiyaah oo ahaa
boqorkii dalka Yahuudah. 9 Oo waxyaalahaas dabadood
ayaa Seenxeeriib oo ahaa boqorkii Ashuur joogay Laakiish
horteeda oo xooggiisii oo dhammuna wuu la jiray, oo wuxuu
addoommadiisii u soo diray Yeruusaalem ilaa Xisqiyaah oo
ahaa boqorkii dalka Yahuudah, iyo ilaa dadkii Yahuudah
oo Yeruusaalem joogay oo dhan, oo wuxuu ku yidhi, 10
Anoo ah Seenxeeriib oo ah boqorkii Ashuur waxaan idinku
leeyahay, Qalcadda Yeruusaalem waa idinka ku sii jiree bal
yaad isku hallaynaysaan? 11 War sow Xisqiyaah idinma
sasabin si aad gaajo iyo harraad ugu dhimataan, isagoo
leh, Rabbiga Ilaaheenna ah ayaa inaga samatabbixin doona
gacanta boqorka Ashuur? 12 War Xisqiyaahaasu sow ma
ahaa kii wada baabbi'iyey meelihiisii sarsare iyo meelihiisii
allabarigaba, oo dadkii Yahuudah iyo Yeruusaalemna sow
kuma uu amrin oo kuma odhan, Idinku waa inaad meel
allabari oo keliya horteeda Ilaah ku caabuddaan, oo isla
taas korkeedana waa inaad fooxa ku shiddaan? 13 War
miyeydaan ka war qabin aniga iyo awowayaashayba wixii
aan ku samaynay dadyowga dalalka deggan oo dhan? War
quruumaha dalalka deggan ilaahyadoodu miyey sinaba u
awoodeen inay dalkooda gacantayda ka samatabbixiyaan?
14 Oo quruumihii awowayaashay ay wada baabbi'iyeen
ilaahyadoodii oo dhan kee baa awooday inuu dadkiisii
gacantayda ka samatabbixiyo? Haddaba Ilaahiinnu sidee
buu u awoodaa inuu gacantayda idinka samatabbixiyo?
15 Haddaba sidaas daraaddeed Xisqiyaah yuusan idin
khiyaanayn oo yuusan sidan idiin sasabin, hana rumaysanina,
waayo, innaba ma jirin quruun ama boqortooyo ilaaheedu
awooday inuu dadkiisa ka samatabbixiyo gacantayda iyo
gacantii awowayaashay toona, haddaba ilaahiinna sidee
buu gacantayda idiinka samatabbixin doonaa? 16 Oo
addoommadiisiina waxay ku sii hadleen war badan oo ka
gees ah Rabbiga Ilaaha ah iyo addoonkiisa Xisqiyaah ahba.
17 Oo weliba wuxuu kaloo qoray warqado uu ku caayayo oo
wax kaga sheegayo Rabbiga ah Ilaaha reer binu Israa'iil,
oo wuxuu yidhi, Dalalka quruumaha deggan ilaahyadoodii
oo dadkoodii gacantayda ka samatabbixin waayay sidoodii
oo kalaa Ilaaha Xisqiyaahna dadkiisa gacantayda uga
samatabbixin waayi doonaa. 18 Oo iyagoo afkii Yuhuudda
ku hadlaya ayay cod weyn ugu dhawaaqeen dadkii reer
Yeruusaalem oo derbiga kor joogay inay iyaga cabsiiyaan
oo ay wareeriyaan si ay iyagu magaalada u qabsadaan.
19 Oo waxay Ilaahii Yeruusaalem uga hadleen siday uga
hadleen ilaahyadii dadadka dunida, kuwaasoo ah wax dad
gacanta ku sameeyey. 20 Markaasaa Boqor Xisqiyaah
iyo Nebi Ishacyaah oo ahaa ina Aamoos u tukadeen
xaalkan aawadiis, oo waxay qaylo gaadhsiyeen samada.
21 Markaasaa Rabbigu malag soo diray, kaasoo xeradii
boqorkii Ashuur ku wada laayay raggii xoogga badnaa,
iyo hoggaamiyayaashii, iyo saraakiishii oo dhanba. Sidaas
daraaddeed isagoo ceebaysan ayuu dalkiisii ku noqday. Oo
markuu gurigii ilaahiisa galay waxaa halkaas seef kaga dilay
wiilashii uu dhalay. 22 Sidaasuu Rabbigu Xisqiyaah iyo dadkii
Yeruusaalem degganaaba uga badbaadiyey Seenxeeriib oo
ahaa boqorkii Ashuur gacantiisii iyo gacantii kuwii kale oo
dhanba, oo iyagiina dhinac kasta wuu ka ilaaliyey. 23 Oo dad
badan ayaa Rabbiga Yeruusaalem ugu keeneen hadiyado,
oo Xisqiyaah oo ahaa boqorkii dalka Yahuudahna waxay u

keeneen waxyaalo qaali ah, sidaas aawadeed markaas intii
ka dambaysay ayaa isaga loogu sarraysiiyey quruumaha oo
dhan hortooda. 24 Oo waagaas ayaa Xisqiyaah bukooday, oo
geeri buu u dhowaaday, markaasuu Rabbiga baryay, oo isna
intuu la hadlay ayuu calaamad u sameeyey. 25 Laakiinse
Xisqiyaah wanaaggii isaga loo sameeyey mahad kama
celin, waayo, qalbigiisa ayaa kibray, sidaas daraaddeed
isagii iyo dalka Yahuudah iyo Yeruusaalemba cadho baa
ku soo degtay. 26 Habase ahaatee Xisqiyaah wuu is-
hoosaysiiyey oo kibirkii qalbigiisa wuu ka soo noqday isaga
iyo dadkii Yeruusaalem degganaa oo dhammuba, sidaa
daraaddeed cadhadii Rabbigu iyaga kuma ay soo degin
wakhtigii Xisqiyaah. 27 Haddaba Xisqiyaah wuxuu lahaa maal
aad iyo aad u faro badan iyo sharaf, oo wuxuu samaystay
khasnado lagu xereeyo lacag, iyo dahab, iyo dhagaxyo qaali
ah, iyo uunsi, iyo gaashaammo, iyo cayn kasta oo weelal
wanaagsan ah. 28 Oo guryo wax lagu kaydiyona buu u
samaystay wixii badnaa ee ahaa hadhuudh iyo khamri iyo
saliid, wuxuuna samaystay xeryo lagu xereeyo xayawaan
cayn kasta ah, iyo xeryo adhi. 29 Oo weliba wuxuu dhistay
magaalooyin, oo wuxuu urursaday ido iyo lo' faro badan,
waayo, Rabbigu wuxuu isaga siiyey maal aad u badan. 30 Oo
Xisqiyaahaas qudhiisa ayaa awday biyihii Giixoon ishoodii
sare, oo wuxuu hoos ugu soo toosiyey magaaladii Daa'uud
dhankeedii galbeed. Oo Xisqiyaahna wuu ku liibaanay
shuqulladiisii uu sameeyey oo dhan. 31 Habase ahaatee
markay amiirradii dalka Baabuloon isaga cid ugu soo direen
inay soo haybiyaan waxa uu yahay yaabka dalkiisa lagu
dhex sameeyo ayaa Ilaah isagii uga tegey inuu tijaabiyo
oo ogaado waxa qalbigiisa ku jira oo dhan. 32 Haddaba
Xisqiyaah falimihiisii kale iyo camalladiisii wanaagsanaa oo
dhammu waxay ku qoran yihiin waxyaalihii la tusay Nebi
Ishacyaah oo ahaa ina Aamoos, kuwaasoo ku yaal kitaabkii
boqorrada dalka Yahuudah iyo dalka Israa'iil. 33 Oo Xisqiyaah
wuu dhintay oo la seexday awowayaashiis, oo waxaa isagii
lagu aasay meesha laga fuulo qabuurihii farcanka Daa'uud;
oo dadkii Yahuudah iyo dadkii Yeruusaalem degganaa oo
dhammuba isagii bay sharfeen markuu geeriyooday. Oo
meeshiisiina waxaa boqor ka noqday wiilkiisii Manaseh.

**33** Oo Manaseh markuu boqor noqday wuxuu jiray
laba iyo toban sannadood, oo Yeruusaalemna wuxuu
boqor ku ahaa shan iyo konton sannadood. 2 Oo isna
wuxuu sameeyey wax Rabbiga hortiisa shar ku ahaa, sidii
karaahiyadii quruumihii Rabbigu ka eryay reer binu Israa'iil
hortooda. 3 Waayo, wuxuu mar kale dhisay meelihii sarsare
ee aabbihiis Xisqiyaah baabbi'iyey, oo Bacaliimna meelo
allabari buu u dhisay, oo geedo Asheeraahna wuu sameeyey,
oo wuxuu caabuday oo u wada adeegay ciidanka samada
oo dhan. 4 Oo wuxuu meelo allabari uga dhex dhisay gurigii
Rabbiga, kaasoo Rabbigu ka hadlay oo yidhi, Magacaygu
wuxuu weligiisba joogi doonaa Yeruusaalem. 5 Oo wuxuu
ciidankii samada oo dhanna meelo allabari uga dhisay labadii
barxadood oo gurigii Rabbiga. 6 Oo weliba carruurtiisiina
dab buu ku dhex mariyey dooxadii ina Xinnom dhexdiisa,
faalna wuu ku noqnoqday, wuxuuna u tegey falanfallowyo,
sixirna wuu ku noqnoqday, oo wuxuu la macaamilooday kuwii
ruuxaanta lahaa iyo saaxiriintii, oo wuxuu Rabbiga hortiisa
ku sameeyey shar badan oo uu isaga kaga xanaajiyey.
7 Oo sanamkii xardhanaa ee uu sameeyey ayuu dhex
qotomiyey gurigii Ilaah ee uu Ilaah ka hadlay oo Daa'uud iyo
wiilkiisii Sulaymaanba ku yidhi, Gurigan iyo Yeruusaalem
dhexdeeda oo aan ka doortay qabiilooyinka reer binu Israa'iil
oo dhan ayaan magacayga weligiisba ku dayn doonaa. 8 Oo
cagta reer binu Israa'iilna mar dambe ka dhaqaajin maayo
dalkii aan u doortay awowayaashood, hadday dhawraan
uun wixii aan ku amray oo dhan, kuwaasoo ah sharcigii
iyo qaynuunnadii iyo xukummadii aan gacanta Muuse u
soo dhiibay oo dhan. 9 Oo Manasehna dadkii Yahuudah
iyo dadkii Yeruusaalem degganaaba wuu qalday, sidaas
daraaddeed iyagu waxay sameeyeen shar ka sii badan kii
ay sameeyeen quruumihii Rabbigu ku hor baabbi'iyey reer
binu Israa'iil. 10 Markaasaa Rabbigu la hadlay Manaseh
iyo dadkiisiiba, laakiinse dheg uma ay dhigin. 11 Sidaas
daraaddeed Rabbigu wuxuu ku diray saraakiishii ciidanka
oo boqorkii Ashuur, oo waxay la tageen Manaseh isagoo
silsilado iyo bircago ku xidhan yihiin, kolkaasay Baabuloon u
kaxaysteen. 12 Oo intuu dhibaataysnaa ayuu baryay Rabbigii
Ilaahiisa ahaa, oo si weyn buu isugu hor hoosaysiiyey Ilaahii
awowayaashiis. 13 Oo isagii buuna baryay, oo isna wuu
aqbalay oo baryootankiisiina wuu maqlay, oo mar kale
ayuu dib ugu soo celiyey Yeruusaalem iyo boqortooyadiisii.
Markaasaa Manaseh ogaaday in Rabbigu Ilaah yahay.
14 Haddaba waxyaalahaas ka dib magaaladii Daa'uud
dibaddeeda ayuu ka dhisay derbi xagga Giixoon dhankeedii
galbeed iyo dooxada dhexdeedii iyo xataa meesha laga galo
Iriddii Kalluunka, oo wuxuu ka soo wareejiyey Cofel, oo aad
iyo aad buu kor ugu dheereeyey, oo magaalooyinkii deyrka
lahaa oo dalka Yahuudah oo dhanna wuxuu fadhiisiyey
saraakiishii ciidanka. 15 Markaasuu ilaahyadii qalaad iyo
sanamkiiba ka bixiyey gurigii Rabbiga, oo meelihii allabariga
ee uu ka dhisay buurtii guriga Rabbiga iyo Yeruusaalem
gudaheedaba dhammaantood wuu dumiyey, oo magaaladii
wuu ka wada tuuray. 16 Markaasuu hagaajiyey meeshii

allabariga ee Rabbiga, oo wuxuu ku dul bixiyey qurbaanno
nabaadiino iyo qurbaanno mahadnaqid ah, oo wuxuu dadkii
Yahuudah ku amray inay u adeegaan Rabbiga ah Ilaaha
reer binu Israa'iil. **17** Habase yeeshee dadkii weli waxay
allabaryo ku bixin jireen meelihii sarsare, laakiinse waxay ula
niyoon jireen Rabbiga ah Ilaahooda oo keliya. **18** Haddaba
Manaseh falimihiisii kale iyo baryadii uu Ilaahiis baryay, iyo
erayadii wax arkayaashii ay isaga kula hadleen magaca
Rabbiga ah Ilaaha reer binu Israa'iil, bal eeg, waxay ku
qoran yihiin kitaabkii falimihii boqorradii dalka Israa'iil. **19** Oo
baryootankiisii, iyo siduu Ilaah isaga u aqbalay, iyo dembigiisii
iyo xadgududkiisii oo dhan, iyo meelihii uu meelo sarsare ka
dhisay ee uu qotomiyey geedihii Asheeraah iyo sanamyadii
xardhanaa intuusan is-hoosaysiin, bal eeg, waxay ku qoran
yihiin taariikhdii Xoosay. **20** Markaasaa Manaseh dhintay oo
la seexday awowayaashiis, oo waxaa lagu aasay gurigiisii,
oo meeshiisiina waxaa boqor ka noqday wiilkiisii Aamoon.
**21** Oo Aamoonna markuu boqor noqday wuxuu jiray laba iyo
labaatan sannadood, Yeruusaalemna boqor buu ku ahaa
laba sannadood. **22** Oo isna wuxuu sameeyey wax shar
ku ah Rabbiga hortiisa sidii aabbihiis Manaseh u yeelay
oo kale. Oo Aamoon wuxuu allabari u bixiyey sanamyadii
xardhanaa ee uu aabbihiis Manaseh sameeyey oo dhan,
wuuna u adeegay. **23** Oo isagu sidii aabbihiis Manaseh uu
isu hoosaysiiyey oo kale isuguma uu hoosaysiin Rabbiga
hortiisa, laakiinse Aamoonkaas qudhiisu aad iyo aad buu u
sii xadgudbay. **24** Oo addoommadiisii ayaa shirqool u dhigay,
oo gurigiisay ku dileen. **25** Laakiinse dadkii dalka degganaa
ayaa wada laayay kuwii Boqor Aamoon sirqoolka u dhigay
oo dhan, oo dadkii dalka degganaa waxay meeshiisii boqor
uga dhigeen wiilkiisii Yoosiyaah.

**34** Yoosiyaah markuu boqor noqday wuxuu jiray siddeed
sannadood, oo Yeruusaalemna boqor buu ku ahaa
kow iyo soddon sannadood. **2** Oo wuxuu sameeyey wixii
Rabbiga hortiisa ku qummanaa, wuuna ku socday jidkii
awowgiis Daa'uud maray, ugamana uu leexan xagga midigta
iyo xagga bidixda toona. **3** Waayo, sannaddii siddeedaad
oo boqornimadiisa intuu weli dhallinyaraa ayuu bilaabay
inuu doondoono Ilaahii awowgiis Daa'uud, oo sannaddii
laba iyo tobnaad ayuu bilaabay inuu reer Yahuudah iyo
reer Yeruusaalem ka nadiifiyo meelihii sarsare, iyo geedihii
Asheeraah, iyo sanamyadii xardhanaa, iyo sanamyadii
shubka ahaaba. **4** Oo meelihii Bacaliim allabariga loogu bixin
jiray oo dhanna hortiisay ku dumiyeen, sanamyadii qorraxda
ee iyaga ka sarreeyeyna wuu wada jaray, oo geedihii
Asheeraah iyo sanamyadii xardhanaa, iyo sanamyadii
shubka ahaana dhammaantood wuu wada burburiyey oo
boodh ka dhigay, oo wuxuu ku dul firdhiyey qabuurihii
kuwii allabariga u bixin jiray. **5** Oo meelahoodii allabarigana
wuxuu ku kor gubay lafihii wadaaddadii, oo dalka Yahuudah
iyo Yeruusaalemba wuu wada nadiifiyey. **6** Oo sidaasoo
kaluu ka wada yeelay magaalooyinkii reer Manaseh iyo reer
Efrayim iyo reer Simecoon iyo xataa kuwii reer Naftaali, iyo
meelahoodii burbursanaa oo ku wareegsanaa oo dhan. **7** Oo
meelihii allabariga wuu wada dumiyey, geedihii Asheeraah
iyo sanamyadii xardhanaana wuu wada budeeyey, oo
sanamyadii qorraxda ee dalka Israa'iil oo dhan ku yiilna
wuu wada jaray, markaasuu Yeruusaalem ku noqday. **8**
Oo sannaddii siddeed iyo tobnaad oo boqornimadiisa,
markuu nadiifiyey dalkii iyo gurigiiba ayuu diray Shaafaan
ina Asalyaah, iyo Macaseeyaah oo ahaa taliyihii magaalada,
iyo Yoo'aax ina Yoo'aaxaas oo ahaa taariikhqore inay
cusboonaysiiyaan gurigii Rabbiga Ilaahiisa ah. **9** Markaasay
u yimaadeen Xilqiyaah oo ahaa wadaadkii sare, oo waxay u
dhiibeen lacagtii guriga Ilaah la geliyey, oo irid-dhawrayaasha
reer Laawi ay ka soo ururiyeen reer Manaseh iyo reer
Efrayim, iyo kuwii kale oo reer binu Israa'iil ah oo dhan,
iyo reer Yahuudah iyo reer Benyaamiin oo dhan, iyo dadkii
Yeruusaalem degganaaba. **10** Oo lacagtii waxay u dhiibeen
shaqaalaha guriga Rabbiga u talin jiray, oo raggii guriga
Rabbiga ka dhex shaqayn jirayna waxay u bixiyeen in
guriga lagu hagaajiyo oo lagu cusboonaysiiyo. **11** Waxay
siiyeen nijaarradii iyo waxdhisayaashii inay ku soo iibiyaan
dhagaxyo la qoray iyo alwaax wax laysku xidho, iyo inay
alwaax saqafka haya u sameeyaan guryihii ay boqorradii
reer Yahuudah dumiyeen. **12** Oo raggiina shuqulkii waxay u
sameeyeen si daacadnimo ah; kuwii u talin jiray oo shuqulka
hore u wadi jirayna waxay ahaayeen Yaaxad iyo Cobadyaah
oo ahaa reer Laawi oo ka ahaa reer Meraarii, iyo Sekaryaah
iyo Meshullaam oo ahaa reer Qohaad, oo waxaa kaloo la jiray
kuwa kale oo reer Laawi ah oo alaabta muusikada karay oo
dhan. **13** Oo weliba waxay kaloo u talin jireen xammaalladii,
hore bayna u wadi jireen shuqulkii kuwii shaqayn jiray oo
dhan, cayn kastoo hawshoodu ahaydba, oo reer Laawina
waxaa ka joogay karraaniyo iyo saraakiil iyo iridjoogayaal.
**14** Oo markay soo bixiyeen lacagtii guriga Rabbiga la geliyey
ayaa wadaadkii Xilqiyaah ahaa helay kitaabkii sharcigii
Rabbiga oo Muuse loo sii dhiibay. **15** Markaasaa Xilqiyaah
jawaabay oo wuxuu karraanigii Shaafaan ku yidhi, Waxaan
gurigii Rabbiga ka dhex helay Kitaabkii Sharciga. Oo
Xilqiyaah kitaabkii buu u dhiibay Shaafaan. **16** Markaasaa
Shaafaan kitaabkii u geeyey boqorkii, oo weliba boqorkii buu
u soo warramay oo ku yidhi, Addoommadaadii way wada

samaynayaan wixii loo dhiibay oo dhan. 17 Oo iyagu lacagtii
guriga Rabbiga laga dhex helay way soo ururiyeen oo waxay
u dhiibeen kuwa shuqulka u taliya iyo ragga shaqaalaha ah.
18 Oo Shaafaan oo karraanigii ahaa ayaa boqorkii u sheegay
oo ku yidhi, Wadaadkii Xilqiyaah ahaa wuxuu ii dhiibay
kitaab. Markaasaa Shaafaan kitaabkii ku akhriyey boqorka
hortiisii. 19 Oo markii boqorkii maqlay erayadii sharciga ayuu
dharkiisii jeexjeexay. 20 Markaasaa boqorkii amray Xilqiyaah,
iyo Axiiqaam ina Shaafaan, iyo Cabdoon ina Miikaah, iyo
Shaafaan oo ahaa karraanigii, iyo Casaayaah oo ahaa
addoonkii boqorka, oo wuxuu ku yidhi, 21 War taga, oo aniga
iyo kuwa dalka Israa'iil iyo dalka Yahuudah ku hadhayba
Rabbiga wax inoo soo weyddiiya waxa ku saabsan erayada
kitaabkii la helay, waayo, cadhada Rabbiga oo inagu soo
degtay way weyn tahay, maxaa yeelay, awowayaasheen ma
ay xajin inay wada yeelaan waxa kitaabkan ku qoran oo
dhan. 22 Markaasaa Xilqiyaah iyo kuwii boqorku amrayba
waxay u tageen nebiyaddii Xuldaah ahayd oo u dhaxday
Shalluum ina Tawqhad, oo ahaa ina Xasraah, kaasoo ahaa
kii dharka dhawri jiray. (Haddaba iyadu waxay degganayd
Yeruusaalem xaafaddeeda labaad.) Markaasay iyadii kala
hadleen xaalkaas. 23 Oo waxay ku tidhi, Rabbiga ah Ilaaha
reer binu Israa'iil wuxuu leeyahay, Waxaad ninkii ii soo
kiin diray u sheegtaan, 24 Rabbigu wuxuu leeyahay, Bal
eeg, belaayaan ku soo dejin doonaa meeshan iyo dadka
degganba, taasoo ah kulli habaarrada ku qoran kitaabkii
boqorka Yahuudah hortiisa lagu akhriyey oo dhan, 25 maxaa
yeelay, iyagu way iga tageen, oo waxay foox u shideen
ilaahyo kale inay igaga xanaajiyaan shuqulka gacmahooda
oo dhan; oo sidaas daraaddeed cadhadaydu waxay ku
kor degtay meeshan, mana qaboobi doonto. 26 Laakiinse
boqorkii dalka Yahuudah oo idiin soo diray inaad Rabbiga
wax soo weyddiisaan waxaad ku tidhaahdaan, Rabbiga ah
Ilaaha reer binu Israa'iil wuxuu ka leeyahay erayadii aad
maqashay: 27 Qalbigaagu wuu jilicsanaa oo Ilaah hortiisa
ayaad isku hoosaysiisay markaad maqashay erayadiisii uu
kaga hadlay meeshan iyo dadka degganba, oo hortayda
ayaad isku hoosaysiisay, oo dharkaagii waad jeexjeexday,
oo waad igu hor ooyday, oo sidaas daraaddeed waan ku
maqlay, ayaa Rabbigu leeyahay. 28 Haddaba waxaan kula
ururin doonaa awowayaashaa, oo qabrigaaga nabad baad
ugu ururi doontaa, oo indhahaaguna ma ay arki doonaan
kulli belaayada aan ku soo dejin doono meeshan iyo dadka
degganba. Oo iyana boqorkii ayay mar kale u war keeneen.
29 Markaasaa boqorkii cid diray oo waxaa loo soo ururiyey
odayaashii dalka Yahuudah iyo kuwii Yeruusaalem oo dhan.
30 Oo boqorkii wuxuu u kacay gurigii Rabbiga oo waxaa
isagii la socday raggii dalka Yahuudah oo dhan, iyo dadkii
Yeruusaalem degganaa, iyo wadaaddadii, iyo kuwii reer
Laawi, iyo dadkii oo dhan yar iyo weynba, oo isna wuxuu
hortooda ku akhriyey dhammaan erayadii kitaabkii axdiga
oo guriga Rabbiga laga dhex helay. 31 Markaasaa boqorkii
istaagay meeshiisii, oo wuxuu Rabbiga hortiisa axdi ugu
maray inuu Rabbiga raaco oo uu qalbigiisa oo dhan iyo
naftiisa oo dhan ku dhawro amarradiisa, iyo markhaatiyadiisa,
iyo qaynuunnadiisa, iyo inuu sii adkeeyo erayadii axdiga
oo kitaabkan ku qornaa. 32 Oo wuxuu ka dhigay in intii
Yeruusaalem iyo dalka reer Benyaamiin laga helay oo
dhanba ay axdiga aqbalaan oo u istaagaan. Oo dadkii
Yeruusaalem degganaana waxay yeeleen si waafaqsan
axdigii Ilaah, kaasoo ahaa Ilaahii awowayaashood. 33
Markaasaa Yoosiyaah karaahiyadii oo dhan ka fogeeyey
dalalka ay dadka Israa'iil lahaayeen oo dhan, oo dadkii
dalka Israa'iil laga dhex helay oo dhanna wuxuu ka dhigay
inay u adeegaan Rabbiga Ilaahooda ah. Oo intuu noolaa
oo dhanna kama ay tegin lasocodka Rabbiga ah Ilaaha
awowayaashood.

**35** Oo Yoosiyaah Yeruusaalem ayuu Rabbiga ugu dhawray
Iiddii Kormaridda, oo neefafkii Kormariddana waxaa la
gowracay bishii kowaad maalinteedii afar iyo tobnaad. 2 Oo
wadaaddadiina ayuu shuqulkoodii loo amray u kala qaybiyey,
oo adeegiddii gurigii Rabbiga ayuu ku dhiirrigeliyey. 3 Oo
kuwii reer Laawi oo dadka Israa'iil oo dhan wax bari jiray ee
Rabbiga aawadiis quduus u ahaa wuxuu ku yidhi, Sanduuqa
quduuska ah waxaad gelisaan gurigii uu dhisay Sulaymaan
oo uu dhalay boqorkii reer binu Israa'iil oo Daa'uud ahaa,
hadda ka dib culaab dambe garbihiinna saarnaan mayso,
haddaba Rabbiga Ilaahiinna ah iyo dadkiisa reer binu Israa'iil
u adeega. 4 Isu diyaariya sida reerihiinna iyo kooxihiinnu
yihiin si waafaqsan qorniinkii uu qoray Daa'uud oo ahaa
boqorkii reer binu Israa'iil, iyo si waafaqsan qorniinkii wiilkiisa
Sulaymaan. 5 Oo waxaad isu taagtaan meesha quduuska ah
sida qaybaha reerihii walaalihiin oo ah dadka dalka ay kala
yihiin, oo reerihii qaar reer Laawi ahi ha isu qaybiyeen. 6 Oo
neefafka Kormaridda gowraca, oo quduus iska dhiga, oo
walaalihiinna u diyaariya, si aad u samaysaan si waafaqsan
Eraygii Rabbiga oo Muuse loo soo dhiibay. 7 Markaasaa
Yoosiyaah wuxuu dadkii intii joogtay oo dhan adhigii ka
siiyey baraar iyo waxarro si ay qurbaannada Kormaridda u
bixiyaan, oo tiradooduna waxay isku ahayd soddon kun, iyo
saddex kun oo dibi, intaasu waxay ahaayeen intii boqorku
maalkiisa ka baxshay. 8 Oo amiirradiisii iyagoo raalli ka
ah ayay wax siiyeen dadkii iyo wadaaddadii iyo kuwii reer

Laawi. Oo Xilqiyaah iyo Sekaryaah iyo Yexii'eel oo ahaa
taliyayaashii guriga Ilaahna waxay wadaaddadii qurbaannadii
Kormaridda u siiyeen laba kun iyo lix boqol oo neef oo
yaryar, iyo saddex boqol oo dibi. 9 Oo weliba Kaananyaah
iyo walaalihiis oo ahaa Shemacyaah iyo Netaneel, iyo
Xashabyaah iyo Yecii'eel iyo Yoosaabaad oo ahaa madaxdii
reer Laawi waxay reer Laawi qurbaannadii Kormaridda u
siiyeen shan kun oo neef oo yaryar, iyo shan boqol oo dibi.
10 Sidaasaa hawshii loo hagaajiyey, oo wadaaddadii iyo
kuwii reer Laawina waxay kala istaageen meelahoodii siday
kooxahoodii kala ahaayeen, taasoo waafaqsan boqorka
amarkiisii. 11 Markaasay gowraceen neefafkii Kormaridda, oo
wadaaddadiina way saydhsaydheen dhiiggii ay gacantooda
ka guddoomeen, oo kuwii reer Laawina harag bay ka
bixiyeen. 12 Oo iyana meel bay dhigeen qurbaannadii la
gubayay inay sidii qaybihii reerihii dadku ay kala ahaayeen
Rabbiga wax ugu bixiyaan si waafaqsan waxa ku qoran
kitaabkii Muuse. Oo dibidiina sidaasoo kalay u galeen. 13
Oo sidii qaynuunku ahaa ayay neefafkii Kormaridda dab
ugu dubeen, oo qurbaannadii quduuska ahaana waxay ku
kariyeen dheryo iyo digsiyo iyo weelal kale oo waaweyn, oo
intay qaadeen ayay haddiiba u geeyeen dadkii oo dhan. 14
Oo dabadeedna wax bay u diyaariyeen nafsaddoodii iyo
wadaaddadii, maxaa yeelay, wadaaddadii reer Haaruun
waxay ilaa habeenkii bixinayeen qurbaannada la gubo iyo
baruurtaba, sidaas daraaddeed kuwii reer Laawi wax bay u
diyaariyeen nafsaddoodii iyo wadaaddadii reer Haaruunba.
15 Oo nimankii gabayaaga ahaa oo reer Aasaafna waxay
joogeen meeshoodii sidii uu ahaa amarkii Daa'uud, iyo
Aasaaf, iyo Heemaan, iyo Yeduutuun oo ahaa boqorka wax
arkihiisii, oo iridjoogayaashiina waxay joogeen irid kasta,
oo iyagu uma ay baahnayn inay hawshooda ka tagaan,
waayo, iyaga waxaa wax u diyaarin jiray walaalahoodii reer
Laawi. 16 Sidaasaa hawshii Rabbiga loo diyaariyey isku
maalintaas in Iidda Kormaridda la dhawro iyo in qurbaannada
la gubo lagu bixiyo meeshii allabariga ee Rabbiga, sidii
uu ahaa amarkii Boqor Yoosiyaah. 17 Reer binu Israa'iil
oo markaas joogayna wakhtigaasay dhawrayeen Iiddii
Kormaridda iyo Iiddii Kibista-aan-khamiirka-lahaynba intii
toddoba maalmood ah. 18 Oo Iiddaas Kormaridda mid la
mid ah dalka Israa'iil laguma iidin tan iyo wakhtigii Nebi
Samuu'eel, oo boqorradii reer binu Israa'iilna midkoodna
ma uu iidin Iiddii Kormaridda siday u iideen Yoosiyaah, iyo
wadaaddadii, iyo kuwii reer Laawi, iyo kulli dadka Yahuudah
iyo dadka Israa'iil ee joogay oo dhan, iyo dadkii Yeruusaalem
degganaaba. 19 Oo Iiddaas Kormaridda waxaa la iiday
sannaddii siddeed iyo tobnaad oo boqornimadii Yoosiyaah.
20 Oo waxyaalahaas oo dhan dabadood markuu Yoosiyaah
macbudkii diyaariyey ayaa boqorkii Masar oo Nekoo la
odhan jiray u soo baxay inuu la diriro Karkemiish oo u
dhowayd Webi Yufraad, oo Yoosiyaahna isagii buu ku soo
baxay. 21 Laakiinse ergooyin buu u diray, oo wuxuu ku
yidhi, Boqorka dalka Yahuudahow, maxaan kaa qabaa?
Maanta adiga kuguma aan soo bixin, laakiinse waxaan ku
soo baxay reerka aan colka la ahay; oo Ilaahna wuxuu igu
amray inaan dhaqsado, haddaba Ilaaha ila jira ka joogso yuu
ku baabbi'ine. 22 Habase yeeshee Yoosiyaah wuu diiday
inuu wejigiisii ka jeediyo, laakiinse wuu ismidab rogay si uu
ula diriro, oo ma uu maqlin erayadii Nekoo ee afka Ilaah ka
soo baxay, wuuse yimid inuu kula diriro dooxadii Megiddoo.
23 Markaasay qaansaleydii fallaadh ku ganeen Boqor
Yoosiyaah, dabadeedna boqorkii wuxuu addoommadiisii ku
yidhi, War si xun baan u dhaawacmaye i fogeeya. 24 Sidaas
daraaddeed addoommadiisii gaadhifaraskii way ka dejiyeen
oo waxay saareen gaadhifaraskii labaad ee uu lahaa, oo
waxay isagii keeneen Yeruusaalem, halkaasuuna ku dhintay,
oo waxaa lagu aasay qabuurihii awowayaashiis. Oo dadkii
Yahuudah iyo Yeruusaalem oo dhan Yoosiyaah way u
baroorteen. 25 Oo Yeremyaahna waa u baroortay Yoosiyaah,
oo ilaa maantadan la joogo ragga gabya iyo naagaha gabya
oo dhanba waxay baroortoodii kaga sheekeeyeen Yoosiyaah,
oo taasna dalka Israa'iil qaynuun baa lagaga dhigay, oo bal
eeg, waxay ku qoran tahay kitaabka baroorta. 26 Haddaba
Yoosiyaah falimihiisii kale iyo camalladiisii wanwanaagsanaa,
sida ku qoran sharciga Rabbiga, 27 iyo falimihiisii intii hore
iyo intii dambeba waxay ku qoran yihiin kitaabkii boqorrada
dalka Israa'iil iyo dalka Yahuudah.

## 36

Markaasaa dadkii waddanku soo wateen Yehoo'aaxaas
ina Yoosiyaah, oo waxay meeshii aabbihiis boqor
ugaga dhigeen Yeruusaalem. 2 Oo Yoo'aaxaasna markuu
boqor noqday wuxuu jiray saddex iyo labaatan sannadood,
oo intii saddex bilood ah ayuu Yeruusaalem boqor ku ahaa.
3 Markaasaa boqorkii Masar Yeruusaalem kaga dejiyey
carshigiisii, oo dalkiina wuxuu saaray baad ah boqol talanti
oo lacag ah iyo talanti dahab ah. 4 Kolkaasaa boqorkii Masar
wuxuu dalkii Yahuudah iyo Yeruusaalemba boqor uga dhigay
walaalkiis Elyaaqiim, oo magiciisiina wuxuu u beddelay
Yehooyaaqiim. Oo walaalkiis Yoo'aaxaasna Nekoo wuxuu
u kaxaystay dalkii Masar. 5 Oo Yehooyaaqiimna markuu
boqor noqday wuxuu jiray shan iyo labaatan sannadood,
oo Yeruusaalemna wuxuu boqor ku ahaa kow iyo toban
sannadood, oo isna wuxuu sameeyey wax shar ku ah
Rabbiga Ilaahiisa ah hortiisa. 6 Oo waxaa isagii ku soo kacay

Nebukadnesar oo ahaa boqorkii Baabuloon, silsilado buuna
ku xidhay oo Baabuloon u kaxaystay. 7 Oo Nebukadnesar
weliba wuxuu kaloo Baabuloon u qaatay weelashii guriga
Rabbiga, oo wuxuu dhigtay macbudkiisii Baabuloon ku yiil. 8
Haddaba Yehooyaaqiim falimihiisii kale, iyo karaahiyadiisii
uu sameeyey, iyo wixii isaga laga helayba, bal eeg,
dhammaantood waxay ku qoran yihiin kitaabkii boqorrada
dalka Israa'iil iyo dalka Yahuudah, oo meeshiisiina waxaa
boqor ka noqday wiilkiisii Yehooyaakiin. 9 Oo Yehooyaakiinna
markuu boqor noqday wuxuu jiray siddeed sannadood, oo
Yeruusaalem boqor buu ku ahaa saddex bilood iyo toban
maalmood, oo isna wuxuu sameeyey wax Rabbiga hortiisa
shar ku ah. 10 Oo markii sannaddii soo wareegtay ayaa
Boqor Nebukadnesar soo cid diray, oo wuxuu Baabuloon
keenay isagii iyo weelashii wanaagsanaa oo gurigii Rabbiga,
oo walaalkiis Sidqiyaahna ayuu boqor uga dhigay dalkii
Yahuudah iyo Yeruusaalem. 11 Oo Sidqiyaahna markuu
boqor noqday wuxuu jiray kow iyo labaatan sannadood,
oo Yeruusaalemna wuxuu boqor ku ahaa kow iyo toban
sannadood. 12 Oo isna wuxuu sameeyey wax Rabbiga
Ilaahiisa ah hortiisa shar ku ah, oo iskuma uu hoosaysiin
Nebi Yeremyaah oo afka Rabbiga ku hadlayay hortiisa. 13
Oo weliba wuxuu ka fallaagoobay Boqor Nebukadnesar oo
isaga Ilaah ku dhaariyey, laakiinse wuu madax adkaaday oo
qalbigiisana wuu qallafiyey si uusan ugu soo noqon Rabbiga
ah Ilaaha reer binu Israa'iil. 14 Oo weliba kuwii wadaaddada
sarsare ahaa iyo dadkiiba si weyn bay u xadgudbeen oo
waxay wada sameeyeen karaahiyadii quruumuhu samayn
jireen oo dhan, oo waxay nijaaseeyeen gurigii Rabbiga, ee
uu isagu Yeruusaalem quduus kaga dhigay. 15 Oo Rabbiga
ah Ilaaha awowayaashood goor wanaagsan ayuu iyagii u
soo diray wargeeyayaashiisii, maxaa yeelay, dadkiisa iyo
meesha rugtiisa ah ayuu u naxay. 16 Laakiinse way ku
majaajiloodeen Ilaah wargeeyayaashiisii, oo eraygiisiina
way quudhsadeen, nebiyadiisiina way fududaysteen, ilaa
ay cadhadii Rabbigu ku dhacday dadkiisii oo dawo loo
waayay. 17 Sidaas daraaddeed wuxuu iyagii ku soo kiciyey
boqorkii reer Kaldayiin, kaasoo raggoodii dhallinyarada ahaa
seef ku laayay iyagoo ku jira gurigii meeshoodii quduuska
ahayd, oo isaguna uma uu nixin wiil ama gabadh, ama
oday ama cirroole, dhammaantoodna wuu u gacangeliyey.
18 Oo weelashii guriga Ilaah oo dhan yar iyo weynba, iyo
khasnadihii guriga Rabbiga, iyo khasnadihii boqorka iyo kuwii
amiirradiisaba dhammaantood wuxuu geeyey Baabuloon. 19
Oo gurigii Ilaah waa la gubay, oo derbiyadii Yeruusaalem
waa la dumiyey, oo guryaheedii waaweynaa oo dhanna waa
la gubay, oo weelasheedii wanaagsanaa oo dhanna waa la
wada baabbi'iyey. 20 Oo kuwii seefta ka baxsadayna wuxuu
u kaxaystay Baabuloon, oo waxay addoommo u ahaan
jireen isaga iyo wiilashiisii ilaa la gaadhay boqortooyadii
Faaris, 21 si uu ku rumoobo Eraygii Rabbiga ee ka baxay
afkii Yeremyaah, ilaa dalkii ku istareexay sabtiyadiisii, waayo,
in alla intii uu baabba'sanaa ayuu sabti dhawrayay, si ay
u dhammaadaan toddobaatan sannadood. 22 In Eraygii
Rabbiga ee Yeremyaah afkiisa ka soo baxay uu ahaado
aawadeed, sannaddii kowaad oo Kuuros oo ahaa boqorkii
Faaris ayaa Rabbigu kiciyey ruuxii Kuuros oo ahaa boqorkii
Faaris, oo isna boqortooyadiisii oo dhan ayuu ogeysiis ugu
dhawaaqay, oo weliba qoray, oo wuxuu yidhi, 23 Kuuros
oo ah boqorka Faaris wuxuu leeyahay, Boqortooyooyinka
dhulka oo dhan waxaa i siiyey Rabbiga ah Ilaaha samada,
oo wuxuu igu amray inaan isaga guri uga dhiso Yeruusaalem
oo ku taal dalka Yahuudah. Haddaba ku alla kii idinku dhex
jira oo dadkiisa ah Rabbiga Ilaahiisa ahu ha la jiro oo isna
ha tago.

# Cesraa

1 In Eraygii Rabbiga ee Yeremyaah afkiisa ka soo baxay
uu ahaado aawadeed, sannaddii kowaad oo Kuuros oo
ahaa boqorkii Faaris ayaa Rabbigu kiciyey ruuxii Kuuros
oo ahaa boqorkii Faaris, oo isna boqortooyadiisii oo dhan
ayuu ogeysiis ugu dhawaaqay oo weliba qoray, oo wuxuu
yidhi, 2 Kuuros oo ah boqorka Faaris wuxuu leeyahay,
Boqortooyooyinka dhulka oo dhan waxaa i siiyey Rabbiga
ah Ilaaha samada; oo wuxuu igu amray inaan isaga guri uga
dhiso Yeruusaalem oo ku taal dalka Yahuudah. 3 Haddaba
ku alla kii idinku dhex jira oo dadkiisa ah Ilaahiisu ha la jiro,
oo isna ha tago Yeruusaalem oo dalka Yahuudah ku taal, oo
ha dhiso guriga Rabbiga ah Ilaaha reer binu Israa'iil oo ku
yaal Yeruusaalem. (Isagu waa Ilaah.) 4 Oo ku alla kii ku
hadha meesha uu deggan yahay, dadka ay isku degmada
yihiin ha ku caawiyaan lacag iyo dahab, iyo xoolo mood iyo
noolba ah, oo ayan ku jirin qurbaanka ay ikhtiyaarkooda ugu
bixiyaan guriga Ilaah oo Yeruusaalem ku yaal. 5 Markaasaa
waxaa kacay madaxdii qolooyinka reer Yahuudah iyo reer
Benyaamiin, iyo wadaaddadii, iyo reer Laawi, iyo xataa
dhammaan intii kale ee Ilaah ruuxooda kiciyey si ay u tagaan
oo ay u dhisaan guriga Rabbiga oo Yeruusaalem ku yaal. 6
Oo kulli intii hareerahooda ku wareegsanayd oo dhammu
waxay gacmahooda ku xoogeeyeen weelal lacag ah iyo
dahab, iyo xoolo mood iyo noolba ah, iyo waxyaalo qaali ah,
oo wixii ikhtiyaarka loo bixiyey ayan ku jirin. 7 Oo weliba
Kuurosna wuxuu soo bixiyey weelashii guriga Rabbiga,
oo Nebukadnesar uu Yeruusaalem ka soo bixiyey oo uu
dhigay gurigii ilaahyadiisa. 8 Oo Kuuros oo ahaa boqorkii
Faaris ayaa alaabtaas soo bixiyey oo u dhiibay qasnajigii
Mitredaad ahaa, oo isna wuxuu u tiriyey Sheeshbasar, oo
reer Yahuudah amiir u ahaa. 9 Oo tiradoodiina waa tan,
soddon saxan oo dahab ah, iyo kun saxan oo lacag ah, iyo
sagaal iyo labaatan mindiyood, 10 iyo soddon maddiibadood
oo dahab ah, iyo afar boqol iyo toban maddiibadood oo
ah lacagta caynka labaad ah, iyo kun weel oo kale. 11
Oo kulligood weelashii dahabka iyo lacagta ahaa waxay
isku ahaayeen shan kun iyo afar boqol. Oo intaas oo dhan
Sheeshbasar wuu wada keenay, markii Yeruusaalem la
keenay maxaabiistii Baabuloon laga soo celiyey.

2 Haddaba kuwanu waa dadkii gobolka ee ka soo
noqday maxaabiisnimadii, oo ku jiray kuwii la kaxaystay,
oo Nebukadnesar oo ahaa boqorkii Baabuloon uu u
kaxaystay Baabuloon, oo ku soo noqday Yeruusaalem
iyo dalkii Yahuudah, mid waluba magaaladiisii, 2 oo
waxay la yimaadeen Serubaabel, Yeeshuuca, Nexemyaah,
Seraayaah, Receelaayaah, Mordekay, Bilshaan, Misfaar,
Bigway, Rexuum, iyo Bacanaah. Haddaba waa tan tiradii
dadkii reer binu Israa'iil: 3 Reer Farcosh waxaa ka soo
noqday laba kun iyo boqol iyo laba iyo toddobaatan, 4
reer Shefatyaahna saddex boqol iyo laba iyo toddobaatan,
5 reer Aaraxna toddoba boqol iyo shan iyo toddobaatan,
6 reer Fahad Moo'aab oo ahaa reer Yeeshuuca iyo reer
Yoo'aabna laba kun iyo siddeed boqol iyo laba iyo toban, 7
reer Ceelaamna kun iyo laba boqol iyo afar iyo konton, 8 reer
Satuuna sagaal boqol iyo shan iyo afartan, 9 reer Sakayna
toddoba boqol iyo lixdan, 10 reer Baaniina lix boqol iyo
laba iyo afartan, 11 reer Beebayna lix boqol iyo saddex iyo
labaatan, 12 reer Casgaadna kun iyo laba boqol iyo laba iyo
labaatan, 13 reer Adoniiqaamna lix boqol iyo lix iyo lixdan, 14
reer Bigwayna laba kun iyo lix iyo konton, 15 reer Caadiinna
afar boqol iyo afar iyo konton, 16 reer Aateer oo ahaa reer
Xisqiyaahna siddeed iyo sagaashan, 17 reer Beesayna
saddex boqol iyo saddex iyo labaatan, 18 reer Yooraahna
boqol iyo laba iyo toban, 19 reer Xaashumna laba boqol iyo
saddex iyo labaatan, 20 reer Gibbaarna shan iyo sagaashan,
21 reer Beytlaxamna boqol iyo saddex iyo labaatan, 22 reer
Netofaahna lix iyo konton, 23 reer Canaatoodna boqol iyo
siddeed iyo labaatan, 24 reer Casmaawedna laba iyo afartan,
25 reer Qiryad Caariim, iyo reer Kefiiraah, iyo reer Bi'irodna
toddoba boqol iyo saddex iyo afartan, 26 reer Raamaah
iyo reer Gebacna lix boqol iyo kow iyo labaatan, 27 reer
Mikmaasna boqol iyo laba iyo labaatan, 28 reer Beytel iyo
reer Aaciina laba boqol iyo saddex iyo labaatan, 29 reer
Nebona laba iyo konton, 30 reer Magbiishna boqol iyo lix iyo
konton, 31 reer Ceelaamtii kalena kun iyo laba boqol iyo afar
iyo konton, 32 reer Haarimna saddex boqol iyo labaatan, 33
reer Lod, iyo reer Xaadiid, iyo reer Oonoona toddoba boqol
iyo shan iyo labaatan, 34 reer Yerixoona saddex boqol iyo
shan iyo afartan, 35 reer Senaacaahna saddex kun iyo lix
boqol iyo soddon. 36 Oo wadaaddadiina waxay ahaayeen
reer Yedacyaah oo ahaa reer Yeeshuuca oo ahaa sagaal
boqol iyo saddex iyo toddobaatan, 37 reer Immeerna kun
iyo laba iyo konton, 38 reer Fashxuurna kun iyo laba boqol
iyo toddoba iyo afartan, 39 reer Haarimna kun iyo toddoba
iyo toban. 40 Kuwii reer Laawina waxay ahaayeen reer
Yeeshuuca iyo reer Qadmii'eel, oo reer Hoodawyaah ka soo
farcamay oo ahaa afar iyo toddobaatan. 41 Oo nimankii
gabayaaga ahaa oo reer Aasaaf ahaana waxay ahaayeen
boqol iyo siddeed iyo labaatan. 42 Oo kuwii irdaha dhawri
jiray oo ahaa reer Shalluum, iyo reer Aateer, iyo reer Talmon,
iyo reer Caquub, iyo reer Xatiitaa, iyo reer Shobay, kulligood

waxay isku ahaayeen boqol iyo sagaal iyo soddon. 43 Oo reer
Netiiniimna waxay ahaayeen reer Siixaa iyo reer Xasufaa, iyo
reer Tabbaacood, 44 iyo reer Qeeros, iyo reer Siicahaa, iyo
reer Faadoon, 45 iyo reer Lebaanaah, iyo reer Xagaabaah,
iyo reer Caquub, 46 iyo reer Xagaab, iyo reer Shalmay,
iyo reer Xaanaan, 47 iyo reer Giddeel, iyo reer Gaxar, iyo
reer Re'aayaah, 48 iyo reer Resiin, iyo reer Neqoodaa, iyo
reer Gasaam, 49 iyo reer Cuusaa, iyo reer Faasee'ax, iyo
reer Beesay, 50 iyo reer Asnaah, iyo reer Mecuuniim, iyo
reer Nefuusiim, 51 iyo reer Baqbuuq, iyo reer Xaquufaa, iyo
reer Xarxuur, 52 iyo reer Basluud, iyo reer Mexiidaa, iyo
reer Xarshaa, 53 iyo reer Barqoos, iyo reer Siiseraa, iyo
reer Temax, 54 iyo reer Nesiyax, iyo reer Xatiifaa. 55 Oo
ilmihii addoommadii Sulaymaanna waxay ahaayeen reer
Sotay, iyo reer Hasofered, iyo reer Feruudaa, 56 iyo reer
Yacalaa, iyo reer Darqoon, iyo reer Giddeel, 57 iyo reer
Shefatyaah, iyo reer Xatiil, iyo reer Fokered Hasebaayiim iyo
reer Aamii. 58 Reer Netiiniim oo dhan iyo ilmihii addoommadii
Sulaymaan waxay isku ahaayeen saddex boqol iyo laba
iyo sagaashan. 59 Oo kuwanuna waxay ahaayeen kuwii ka
tegey Teel Melax, iyo Teel Xarshaa, iyo Keruub, iyo Addaan,
iyo Immeer, laakiinse iyagu ma ay sheegi karin qabiilkoodii
iyo jilibkoodii, iyo inay reer binu Israa'iil ahaayeen iyo in
kale toona, 60 oo reer Delaayaah, iyo reer Toobiyaah, iyo
reer Neqoodaa waxay isku ahaayeen lix boqol iyo laba iyo
konton. 61 Oo kuwii wadaaddada ahaa, waxay ahaayeen
reer Xabayaah, iyo reer Xaqoos, iyo reer Barsillay oo naag
ka guursaday gabdhaha Barsillay oo ahaa reer Gilecaad,
oo iyaga lagu magacaabay. 62 Kuwanu magacyadoodii
waxay ka doondooneen buuggii abtiriska, laakiinse lagama
helin, sidaas aawadeed wadaadnimadii waa laga saaray
sidii iyagoo nijaas ah. 63 Oo taliyihii baa iyagii ku amray
inayan waxyaalaha quduuska ah wax ka cunin jeer wadaad
Uuriim iyo Tummiim leh kaco. 64 Oo ururka oo dhammu
wuxuu giddigiis isku ahaa laba iyo afartan kun iyo saddex
boqol iyo lixdan, 65 oo intaas waxaa gooni ka ahaa raggii
addoommadooda ahaa iyo naagihii addoommahooda ahaa,
oo iyana waxay ahaayeen toddoba kun iyo saddex boqol iyo
toddoba iyo soddon, oo waxay lahaayeen laba boqol oo
ah rag iyo naago gabya. 66 Fardahoodu waxay ahaayeen
toddoba boqol iyo lix iyo soddon; baqlahooduna laba boqol
iyo shan iyo afartan, 67 geelooduna afar boqol iyo shan
iyo soddon, dameerahooduna lix kun iyo toddoba boqol
iyo labaatan. 68 Oo qaar ah madaxdii qabiilooyinka ayaa
markay yimaadeen gurigii Rabbiga oo Yeruusaalem ku yaal
ikhtiyaarkood wax ugu bixiyey in gurigii Rabbiga meeshiis
laga dhiso. 69 Iyagu intay awoodeen ayay khasnaddii
shuqulka siiyeen kow iyo lixdan kun oo dirham oo dahab ah,
iyo shan kun oo mina oo lacag ah, iyo boqol khamiis oo ah
dhar wadaadood. 70 Sidaas daraaddeed wadaaddadii, iyo
kuwii reer Laawi, iyo dadkii qaarkiis, iyo nimankii gabayaaga
ahaa, iyo irid-dhawryadii, iyo reer Netiiniimba waxay degeen
magaalooyinkoodii, oo reer binu Israa'iil oo dhammuna
waxay degeen magaalooyinkoodii.

3 Oo markii bishii toddobaad la gaadhay, oo ay reer binu
Israa'iilna iska degganaayeen magaalooyinkoodii, ayaa
dadkii oo dhammu ugu soo wada urureen Yeruusaalem
sidii nin keliya. 2 Markaasaa waxaa istaagay Yeeshuuca oo
ahaa ina Yoosaadaaq, iyo walaalihiisii wadaaddada ahaa,
iyo Serubaabel oo ahaa ina Salaatii'eel, iyo walaalihiis,
oo waxay dhiseen meeshii allabariga Ilaaha reer binu
Israa'iil inay ku dul bixiyaan qurbaanno la gubo, sida ay ugu
qoran tahay sharcigii Muuse oo ahaa ninka Ilaah. 3 Oo
meeshii allabariga waxay saareen saldhiggeedii, waayo,
iyagu waxay ka cabsanayeen dadkii dalalka degganaa, oo
waxay Rabbiga ugu dul bixiyeen qurbaanno la gubo oo
ahaa kuwii subaxnimada iyo kuwii habeennimada. 4 Oo
iiddii taambuugyadana waxay u iideen sidii ay u qornayd,
oo maalin kastana waxay tiro ku bixinayeen qurbaannada
la gubo, sidii amarku ahaa, iyo intii maalin kasta layska
doonayay; 5 dabadeedna qurbaankii joogtada ahaa, iyo kuwii
bilaha cusub, iyo iidihii Rabbiga oo quduuska ahaa, iyo kii
qof waluba Rabbiga ikhtiyaarkiisa ugu bixiyey. 6 Oo maalintii
kowaad oo bishii toddobaad ayay bilaabeen inay Rabbiga u
bixiyaan qurbaanno la gubo, laakiinse macbudka aasaaskiisii
weli lama dhigin. 7 Oo waxay wastaadyadii iyo nijaarradii
siiyeen lacag; oo kuwii reer Siidoon iyo kuwii reer Turosna
waxay siiyeen cunto, iyo cabniin, iyo saliid si ay geedaha
kedarka la yidhaahdo Lubnaan uga keenaan oo ay badda u
soo marsiiyaan ilaa Yaafaa, sidii uu Kuuros oo ahaa boqorkii
Faaris ugu oggolaaday. 8 Haddaba markay yimaadeen
guriga Ilaah oo Yeruusaalem ku yaal sannaddii labaad
bisheedii labaad ayay Serubaabel oo ahaa ina Salaatii'eel,
iyo Yeeshuuca oo ahaa ina Yoosaadaaq, shuqulkii bilaabeen,
iyaga iyo intii kale oo ahayd wadaaddadii walaalahood
ahaa, iyo kuwii reer Laawi, iyo kulli intii maxaabiista ka
soo baxday oo Yeruusaalem timid, oo kuwii reer Laawi
intii labaatan sannadood jirtay ama ka sii weyn ayay u
doorteen inay shuqulkii guriga Rabbiga u sarreeyaan. 9
Markaasaa waxaa dhammaan istaagay Yeeshuuca, iyo
wiilashiisii iyo walaalihiis, iyo Qadmii'eel iyo wiilashiisii oo
ahaa reer Yahuudah, inay u sarreeyaan shaqaalaha ku
jira guriga Rabbiga, iyo weliba wiilashii Xeenaadaad iyo

wiilashoodii iyo walaalahood oo ahaa reer Laawi. 10 Oo
kuwii gurigii dhisayay markay aasaaskii macbudka Rabbiga
dhigeen waxaa istaagay wadaaddadii iyagoo dharkoodii
xidhan oo turumbooyin wata, iyo kuwii reer Laawi oo ahaa
ilma Aasaaf oo haysta suxuun laysku garaaco, inay Rabbiga
ammaanaan sidii uu ahaa amarkii Daa'uud oo ahaa boqorkii
reer binu Israa'iil. 11 Oo markaasay darandoorri u gabyeen
iyagoo Rabbiga ammaanaya oo u mahadnaqaya, oo leh,
Isagu wuu wanaagsan yahay, reer binu Israa'iilna weligiisba
wuu u naxariistaa. Oo markay Rabbiga ammaaneen ayaa
dadkii oo dhammu dhawaaq weyn ku dhawaaqay, maxaa
yeelay, waxaa la dhigay aasaaskii gurigii Rabbiga. 12 Oo
wadaaddadii badidood, iyo kuwii reer Laawi, iyo madaxdii
qabiilooyinka oo ahaa odayaashii arkay gurigii hore ayaa
aad u ooyay markay arkeen gurigan aasaaskiisii oo hortooda
lagu dhigay, oo kuwo badanuna farxad bay la qayliyeen, 13
oo sidaas daraaddeed dadkii wuu kala sooci kari waayay
dhawaaqii farxadda iyo qayladii oohinta, oo buuqiina waxaa
laga maqlay meel fog.

4 Haddaba cadaawayaashii reer Yahuudah iyo reer
Benyaamiin markay maqleen inay kuwii maxaabiistii
ahaan jiray macbud u dhisayeen Rabbiga ah Ilaaha reer
binu Israa'iil, 2 ayay u soo dhowaadeen Serubaabel, iyo
madaxdii qabiilooyinka, oo waxay ku yidhaahdeen, Annana
aan idinla dhisno, waayo, Ilaahiinna waan u doonnaa
sidiinnoo kale, oo isaga allabari baan u bixin jirnay tan iyo
waagii uu Eesar Xaddoon oo boqorkii Ashuur ahaa halkan
na keenay. 3 Laakiinse Serubaabel iyo Yeeshuuca, iyo
madaxdii qabiilooyinka reer Israa'iil intoodii kaleba waxay ku
yidhaahdeen, Idinka waxba idinkama gelin inaad Ilaahayaga
guri noola dhistaan, laakiinse annagaa dhammaantayo guri u
dhisayna Rabbiga ah Ilaaha reer binu Israa'iil, sidii uu Boqor
Kuuros oo ahaa boqorkii Faaris nagu amray. 4 Markaasaa
dadkii dalka degganaa waxay daaliyeen gacmihii dadkii reer
Yahuudah, oo waxdhisiddiina way ka cabsiiyeen, 5 oo waxay
u soo kiraysteen taliyayaal si ay qasdigoodii uga xumeeyaan,
Kuuros oo ahaa boqorkii Faaris wakhtigiisii oo dhan, iyo
tan iyo xataa dowladnimadii Daariyus oo ahaa boqorkii
Faaris. 6 Oo waagii Ahashwerus boqortooyada qabsaday
markii dowladnimadiisu bilaabatay ayay ashtako ka soo
qoreen dadkii degganaa Yahuudah iyo Yeruusaalem. 7 Oo
wakhtigii Artaxshasta ayaa Bishlaam, Mitredaad, Taabeel,
iyo saaxiibbadiisii kale arji u soo qoray Artaxshasta oo ahaa
boqorkii Faaris, oo warqadda farteedu waxay ahayd tan
Suuriya, waxaana lagu micneeyey afka Suuriya. 8 Taliyihii
Rexuum ahaa iyo karraanigii Shimshay ahaa ayaa sidan
warqad Yeruusaalem ka gees ah ugu soo qoray Boqor
Artaxshasta. 9 Markaasaa waxaa qoray taliyihii Rexuum
ahaa iyo karraanigii Shimshay ahaa, iyo saaxiibbadoodii kale
oo ahaa reer Diinaayee, iyo reer Afarsatkaayee, iyo reer
Tarfelaayee, iyo reer Afaarsaayee, iyo reer Arkewaayee,
iyo reer Baabuloon, iyo reer Shuushankaayee, iyo reer
Dehaayee, iyo reer Ceelaam, 10 iyo quruumaha intoodii kale
oo boqorkii weynaa oo gobta ahaa Aasnafar u soo gudbiyey
oo dejiyey magaalada Samaariya iyo dalka intiisa kaloo
webiga ka shishaysa iyo wixii la mid ah. 11 Kanu waa naqilkii
warqaddii ay Boqor Artaxshasta u direen: Dadka webiga
ka shisheeya, oo addoommadaada ahu waxay leeyihiin,
12 Boqorow, bal ogow, in Yuhuuddii kaa soo kacday ay
Yeruusaalem noogu yimaadeen, oo ay dhisayaan magaaladii
caasiga ahayd oo xumayd, oo derbiyadii way dhammeeyeen,
aasaaskiina way hagaajiyeen. 13 Haddaba boqorow bal
ogow, in haddii magaaladan la dhiso, oo derbiyadeeda la
dhammeeyo, ayan iyagu markaas bixin doonin gabbaro,
canshuur, amase baad, ugudambaystana boqorraday wax
yeeli doontaa. 14 Haddaba annagu waxaannu cunnaa
cusbada hoygaaga, boqorow, oo naguma habboona inaannu
aragno adigoo lagu ciso jebiyey, oo sidaas daraaddeed
ayaan kuugu soo cid dirnay oo kuu ogeysiinnay, boqorow,
15 si loo baadho buugaggii taariikhda oo awowayaashaa, oo
sidaasaad buugagga taariikhda uga heli doontaa oo u ogaan
doontaa in magaaladanu tahay magaalo caasi ah, oo ay
u waxyeello badan tahay boqorrada iyo gobolladaba, iyo
in iyada waagii hore fallaagada laga kiciyey, oo sababtaas
aawadeed baa magaaladan loo dumiyey. 16 Boqorow,
waxaannu ku ogeysiinaynaa in haddii magaaladan la dhiso,
oo derbiyadeeda la dhammeeyo, aadan sababtaas aawadeed
waxba qayb ku yeelan doonin inta webiga ka shishaysa. 17
Markaasaa boqorkii wuxuu warqad jawaab ah u soo diray
taliyihii Rexuum ahaa, iyo karraanigii Shimshay ahaa, iyo
intii kaloo saaxiibbadooda ahayd oo Samaariya degganaa,
iyo dadkii kaloo webiga shishadiisa degganaa, oo wuxuu
yidhi, Nabad iyo wax la mid ahu korkiinna ha ahaadeen. 18
Warqaddii aad noo soo dirteen bayaan ayaa hortayda loogu
akhriyey. 19 Oo anna amar baan bixiyey, oo buugaggii baa
la baadhay, oo waxaa la helay in magaaladanu waagii hore
boqorro ku kici jirtay, iyo in dhexdeeda lagu caasiyoobi jiray
oo lagu fallaagoobi jiray. 20 Oo weliba Yeruusaalem waxaa
xukumi jiray boqorro xoog badan, oo waxay u talin jireen inta
webiga ka shishaysa oo dhan, oo gabbaro, iyo canshuur, iyo
baadba waa la siin jiray. 21 Haddaba idinku waxaad amar
ku bixisaan in nimankaasu shuqulka joojiyaan iyo inaan
magaaladaas la dhisin ilaa aan amar bixiyo. 22 Oo idinku

iska jira inaydnaan xaalkaas daynin, waayo, bal maxaa
khasaare ugu sii kordhaya in waxyeello boqorrada gaadho?
23 Oo markii Boqor Artaxshasta warqaddiisii naqilkeedii
lagu hor akhriyey Rexuum iyo karraanigii Shimshay ahaa,
iyo saaxiibbadood, haddiiba waxay degdeg ugu tageen
Yuhuuddii Yeruusaalem joogtay, oo waxay ku joojiyeen
qasab iyo xoog. 24 Oo markaasuu joogsaday shuqulkii
guriga Ilaah Yeruusaalem ku yaal; oo wuxuu joogsaday ilaa
sannaddii labaad oo dowladnimadii Daariyus oo boqorkii
Faaris ahaa.

5 Haddaba nebiyadii ahaa Nebi Xaggay, iyo Sekaryaah
ina Iddo ayaa wax u sii sheegay Yuhuuddii degganayd
Yahuudah iyo Yeruusaalem, oo magaca Ilaaha reer binu
Israa'iil ayay wax ugu sii sheegeen. 2 Markaasaa waxaa
kacay Serubaabel oo ahaa ina Salaatii'eel, iyo Yeeshuuca
oo ahaa ina Yoosaadaaq, oo waxay bilaabeen inay dhisaan
gurigii Ilaah oo ku yaal Yeruusaalem; oo waxaa iyaga la
jiray oo caawinayay nebiyadii Ilaah. 3 Oo isla markaasba
waxaa u yimid Tatenay oo ahaa taliyihii dalka webiga
ka shisheeya, iyo Shetar Boosnay iyo saaxiibbadood, oo
waxay ku yidhaahdeen, War yaa amar idin siiyey inaad
gurigan dhistaan, iyo inaad derbigan dhammaysaan? 4
Markaasaannu sidan kula hadalnay, oo ku nidhi, Nimanka
dhismahan dhisaya magacyadooda maxaa la yidhaahdaa?
5 Laakiinse duqowdii Yuhuudda waxaa isha ku hayay
Ilaahooda, oo iyana shuqulkii ma ay joojin ilaa xaalku soo
gaadho Daariyus, oo warqad jawaab ah ee taas ku saabsan
loo soo celiyo. 6 Tanu waa naqilkii warqaddii Tatenay oo
ahaa taliyihii dalka webiga ka shisheeya, iyo Shetar Boosnay,
iyo saaxiibbadiis oo ahaa reer Afarsekaayee oo webiga
shishadiisa joogay ay u soo direen boqorkii Daariyus. 7
Warqad bay u direen, oo waxaa ku qornaa wax sidan
ah: Boqor Daariyusow, nabadi korkaaga ha ahaato. 8
Boqorow, bal ogow inaannu tagnay gobolka Yahuudah, oo
soo aragnay gurigii Ilaaha weyn, oo dhagaxyo waaweyn
lagu dhisay, oo derbiyadiisana alwaax la dhex geliyey, oo
shuqulkaasuna dadaal buu ku socdaa oo gacmahooduu
ku liibaanaa. 9 Oo waxaannu duqowdaas weyddiinnay oo
ku nidhi, Yaa idin siiyey amar aad gurigan ku dhistaan, oo
aad derbigan ku dhammaysaan? 10 Oo haddana waxaannu
kaloo weyddiinnay magacyadoodii, si aan kuu ogeysiinno,
iyo si aan kuugu soo qorno nimanka madaxdooda ah
magacyadooda. 11 Oo iyana sidanay jawaab noogu soo
celiyeen oo yidhaahdeen, Waxaannu nahay addoommadii
Ilaaha samada iyo dhulka, oo waxaannu dhisaynaa gurigan
oo sannado badan oo hore la dhisay, oo boqor weyn oo reer
binu Israa'iil ahu uu dhisay oo dhammeeyey. 12 Laakiinse
awowayaashayadii waxay ka xanaajiyeen Ilaaha samada,
oo taas daraaddeed ayuu ugu riday gacantii Nebukadnesar
oo ahaa boqorkii Baabuloon, kii reer Kaldayiin oo gurigan
dumiyey oo dadkiina Baabuloon u kaxaystay. 13 Laakiinse
Kuuros oo ahaa boqorkii Baabuloon sannaddiisii kowaad
ayaa Boqor Kuuros bixiyey amar lagu dhiso gurigan Ilaah. 14
Oo weliba weelashii dahabka iyo lacagta ahaa ee gurigii Ilaah
oo uu Nebukadnesar ka qaaday macbudkii Yeruusaalem
ku yiil oo uu geeyey macbudkii Baabuloon, kuwaas boqor
Kuuros wuu ka soo bixiyey macbudkii Baabuloon, oo waxaa
loo soo dhiibay mid magiciisa la odhan jiray Sheeshbasar, oo
uu isagu taliye ka dhigay; 15 oo wuxuu isagii ku yidhi, Tag oo
weelashan qaad, oo waxaad gelisaa macbudka Yeruusaalem
ku yaal, oo gurigii Ilaahna ha laga dhiso meeshiisii. 16
Markaasaa Sheeshbasarkii yimid, oo wuxuu dhigay aasaaskii
guriga Ilaah oo Yeruusaalem ku yaal, oo tan iyo waagaas
waa la dhisayay, laakiinse weli lama dhammaystirin. 17
Haddaba sidaas daraaddeed, haddii ay kula wanaagsan
tahay, boqorow, bal ha la baadho gurigaaga khasnadda ah
oo Baabuloon ku yaal, bal inay saas tahay in Boqor Kuuros
amar ku bixiyey in la dhiso gurigan Ilaah oo Yeruusaalem ku
yaal, oo noo soo dir wixii aad xaalkan ka damacsan tahay.

6 Markaasaa Boqor Daariyus amar bixiyey, oo waa la
baadhay gurigii buugagga taariikhda oo khasnadaha
la dhigi jiray ee Baabuloon ku dhex yiil. 2 Markaasaa
magaalada Axmetaa la yidhaahdo oo ku tiil gobolka Maadi
ayaa hoygii boqorka laga helay qorniin duudduuban, oo
waxaa xusuus ugu qornaa wax sidan ah. 3 Sannaddii
kowaad oo Boqor Kuuros ayaa Boqor Kuuros bixiyey amar
ku saabsan guriga Ilaah oo Yeruusaalem ku yaal, oo wuxuu
yidhi, Guriga ha la dhiso, kaasoo ah meeshii allabaryo
lagu bixiyo, oo aasaaskiisana si adag ha loo dhigo, oo
sarajooggiisu ha ahaado lixdan dhudhun, ballaadhkiisuna
lixdan dhudhun; 4 oo ha lagu dhiso saddex saf oo dhagaxyo
waaweyn ah iyo saf alwaax cusub ah; kharashkiisana ha
laga bixiyo guriga boqorka. 5 Oo weliba weelashii guriga
Ilaah oo ahaa dahabka iyo lacagta oo Nebukadnesar uu
ka soo qaaday macbudka Yeruusaalem ku yaal, oo uu
keenay Baabuloon, ha la celiyo, oo mar dambe ha la geeyo
macbudka Yeruusaalem ku yaal, mid kastaba meeshiisii
ha la dhigo, oo waxaad gelisaa guriga Ilaah. 6 Haddaba
sidaas daraaddeed Tatenay, oo ah taliyaha dalka webiga
ka shisheeya, iyo Shetar Boosnay, iyo saaxiibbadiinna reer
Afarsekaayee oo webiga shishadiisa joogow, idinku halkaas
iskaga fogaada, 7 oo gurigan Ilaah shuqulkiisa faraha ka
qaada, oo taliyaha Yuhuudda iyo odayaasha Yuhuuddu

gurigan Ilaah meeshiisii ha ka dhiseen. 8 Oo weliba waxaan
amar ku bixiyey wixii aad u samayn lahaydeen odayaashan
Yuhuudda oo dhisaya gurigan Ilaah. Waa in alaabta boqorka
iyo xataa gabbarada laga qaado inta webiga ka shishaysa
nimankan kharash loo siiyo iyadoo aad loogu dadaalayo,
si aan iyaga loo hor joogsan innaba. 9 Oo wax alla wixii
ay u baahan yihiin oo ay wadaaddada Yeruusaalem jooga
idin weyddiistaan oo ah dibi yaryar, iyo wanan, iyo baraar,
oo ay Ilaaha samada qurbaanno la gubo ugu bixiyaan, iyo
sarreen, iyo cusbo, iyo khamri, iyo saliidba ha la siiyo maalin
kasta, oo yaan laga baajin, 10 inay iyagu Ilaaha samada u
bixiyaan allabaryo caraf udgoon, oo ay u duceeyaan boqorka
naftiisa iyo tan wiilashiisaba. 11 Oo weliba waxaan kaloo
amar ku bixiyey in ku alla kii eraygan beddela gurigiisa loox
weyn laga bixiyo, oo inta la qotomiyo, isaga lagu deldelo,
oo gurigiisana taas aawadeed ha laga dhigo taallo digo
ah, 12 oo Ilaahii magiciisa halkaas dejiyey ha afgembiyo
boqorradii iyo dadkii gacantooda u soo fidiya inay amarkaas
beddelaan si ay u dumiyaan gurigaas Ilaah oo Yeruusaalem
ku yaal. Anigoo Daariyus ah amar baan bixiyey, ee haddaba
dadaal ha loo sameeyo. 13 Wixii Boqor Daariyus u soo
diray aawadiis ayay Tatenay oo ahaa taliyihii dalka webiga
ka shisheeya, iyo Shetar Boosnay, iyo saaxiibbadoodba
dadaal ku wada sameeyeen. 14 Oo duqowdii Yuhuudduna
waxay wax ku dhiseen oo ku liibaaneen wax sii sheegiddii
Nebi Xaggay iyo Sekaryaah oo ahaa ina Iddo. Oo iyagu
macbudkii way dhiseen oo dhammeeyeen, sidii uu ahaa
amarkii Ilaaha reer binu Israa'iil, iyo sidii uu ahaa amarkii
Kuuros, iyo Daariyus, iyo Artaxshasta oo ahaa boqorkii
Faaris. 15 Oo gurigaas dhismihiisii waxaa la dhammeeyey
sannaddii lixaad oo dowladnimadii Boqor Daariyus bishii
Adaar maalinteedii saddexaad. 16 Oo reer binu Israa'iil,
iyo wadaaddadii, iyo reer Laawi, iyo dadkii maxaabiista
ka soo noqday intoodii kaleba gurigan Ilaah gaar bay uga
dhigeen iyagoo faraxsan. 17 Oo markay gurigan Ilaah gaar
uga dhigayeen waxay u bixiyeen boqol dibi, iyo laba boqol
oo wan, iyo afar boqol oo baraar ah; oo qurbaan dembina
waxay reer binu Israa'iil oo dhan ugu bixiyeen laba iyo toban
orgi intii ay ahaayeen tirada qabiilooyinkii reer binu Israa'iil.
18 Oo sida kitaabkii Muuse ku qoran waxay wadaaddadii u
qaybiyeen qaybahoodii, kuwii reer Laawina jagooyinkoodii,
adeegidda Ilaah oo Yeruusaalem laga adeegayo aawadeed.
19 Oo bishii kowaad maalinteedii afar iyo tobnaad ayaa dadkii
maxaabiisnimada ka soo noqday waxay dhawreen Iiddii
Kormaridda. 20 Waayo, wadaaddadii iyo kuwii reer Laawi
way iswada daahirsheen dhammaantood; oo giddigood
daahir bay ahaayeen, markaasay neefkii Kormaridda u
bireeyeen dadkii maxaabiisnimada ka soo noqday oo dhan,
iyo wadaaddadii walaalahood ahaa, iyo naftoodiiba. 21 Oo
waxaa cunay reer binu Israa'iil oo maxaabiisnimada ka
soo noqday, iyo in alla intii naftooda gooni uga soocday
nijaastii dadkii dalka degganaa inay doondoonaan Rabbiga
ah Ilaaha reer binu Israa'iil, 22 oo waxay toddoba maalmood
farxad ku dhawreen Iiddii Kibista-aan-khamiirka-lahayn,
waayo, Rabbigu aad buu uga farxiyey, oo wuxuu iyaga
u soo jeediyey qalbigii boqorkii Ashuur inuu gacmahooda
xoogeeyo intay ka shaqaynayeen gurigii Ilaah, kaasoo ah
Ilaaha reer binu Israa'iil.

7 Haddaba waxyaalahaas dabadeed intii Artaxshasta
oo boqorkii Faaris ahaa dowladnimada haystay ayaa
Baabuloon waxaa ka soo kacay Cesraa ina Seraayaah,
oo ahaa ina Casaryaah, ina Xilqiyaah, 2 ina Shalluum, ina
Saadooq, ina Axiituub, 3 ina Amaryaah, ina Casaryaah,
ina Meraayood, 4 ina Seraxyaah, ina Cusii, ina Buqii, 5
ina Abiishuuca, ina Fiinexaas, ina Elecaasaar, ina Haaruun
kii ahaa wadaadka sare; 6 oo Cesraahan ayaa ka tegey
Baabuloon, oo wuxuu ahaa karraani aad u yaqaan sharcigii
Muuse uu Rabbiga ah Ilaaha reer binu Israa'iil siiyey;
oo boqorkuna wuxuu siiyey wixii uu weyddiistay oo dhan
sidii ay gacantii Rabbiga Ilaahiis ahu u saarnayd. 7 Oo
sannaddii toddobaad oo dowladnimadii Boqor Artaxshasta
waxaa Yeruusaalem tegey qaar ah reer binu Israa'iil, iyo
wadaaddada, iyo reer Laawi, iyo nimankii gabayaaga
ahaa, iyo irid-dhawryadii, iyo reer Netiiniim. 8 Oo wuxuu
Yeruusaalem yimid boqorka sannaddiisii toddobaad, bisheedii
shanaad. 9 Baabuloon ayuu ka soo baxay bishii kowaad
maalinteedii kowaad, oo wuxuu Yeruusaalem yimid bishii
shanaad maalinteedii kowaad, sidii ay gacantii Ilaahiisa
oo wanaagsanayd u saarnayd. 10 Waayo, Cesraa wuxuu
qalbigiisa u diyaariyey inuu doondoono oo sameeyo Rabbiga
sharcigiisa iyo inuu reer binu Israa'iil baro qaynuunno
iyo xukummo. 11 Haddaba kanu waa naqilkii warqaddii
uu Boqor Artaxshasta siiyey Cesraa oo ahaa wadaadkii
iyo karraanigii kaasoo ahaa karraanigii erayadii amarrada
Rabbiga iyo qaynuunnadiisii uu reer binu Israa'iil siiyey.
12 Anigoo ah Artaxshasta boqorkii boqorrada, waxaan u
qorayaa wadaadkii Cesraa oo ah karraanigii sharciga Ilaaha
samada ee kaamil ah, iyo wax la mid ah. Salaan 13
Waxaan amar ku bixinayaa in dadka reer binu Israa'iil, iyo
wadaaddadooda, iyo reer Laawi, inta boqortooyadayda ku
jirta, ee ikhtiyaarkooda u doonaya inay Yeruusaalem tagaan,
ay dhammaan ku raacaan. 14 Waxaa ku soo diray boqorkii
iyo toddobadiisii lataliye inaad soo warsatid Yahuudah

iyo Yeruusaalem, sida waafaqsan sharciga Ilaahaaga oo
gacantaada ku jira, 15 iyo inaad qaaddid lacagta iyo dahabka
ay boqorka iyo lataliyayaashiisu ikhtiyaarkooda ugu bixiyeen
Ilaaha reer binu Israa'iil oo rugtiisu tahay Yeruusaalem, 16
iyo kulli lacagta iyo dahabka aad ka heli doonto gobolka
Baabuloon oo dhan, iyo qurbaanka dadku ikhtiyaarka u
bixiyo, iyo kan wadaaddadu ay ikhtiyaarkooda ugu bixiyaan
guriga Ilaahooda oo Yeruusaalem ku yaal aawadiis, 17
haddaba sidaas daraaddeed waa inaad aad ugu dadaashaa
inaad lacagtan ku iibiso dibi, iyo wanan, iyo baraar, iyo
qurbaannadooda hadhuudhka ah, iyo qurbaannadooda
cabniinka ah, oo aad ku dul bixisaa meesha allabariga
ee guriga Ilaahaaga oo Yeruusaalem ku yaal. 18 Oo
lacagta iyo dahabka intooda kale ku sameeya wax alla wixii
adiga iyo walaalahaa idinla wanaagsan oo sida Ilaahiin
doonayo ah. 19 Oo weelasha laguugu dhiibay in lagu qabto
adeegidda guriga Ilaahaaga waxaad hor geeysaa Ilaaha
Yeruusaalem. 20 Oo wax alla wixii kaloo loogu baahan
yahay guriga Ilaahaaga aawadiis, ee kugu habboon inaad
bixiso, ka bixi boqorka gurigiisa khasnadda ah. 21 Oo weliba
anigoo ah Boqor Artaxshasta waxaan amar ku siinayaa
khasnajiyada webiga shishadiisa jooga oo dhan, in dadaal
lagu sameeyo wax alla wixii uu idin weyddiisto wadaadka
Cesraa oo ah karraaniga sharciga Ilaaha samada, 22 intii ku
siman boqol talanti oo lacag ah, iyo boqol kor oo sarreen
ah, iyo boqol bad oo khamri ah, iyo boqol bad oo saliid
ah, iyo cusbo aan la xisaabin intay tahay. 23 Haddaba
wax alla wixii Ilaaha samadu uu amro saas dadaal ha
loogu sameeyo guriga Ilaaha samada aawadiis, waayo,
bal maxay cadho ugu dhacaysaa boqortooyada boqorka
iyo wiilashiisa? 24 Oo weliba waxaannu ku ogeysiinaynaa
inaanay xalaal ahaan doonin in gabbaro, canshuur, amase
baad toona la saaro wadaaddada, iyo kuwa reer Laawi,
iyo nimanka gabayaaga ah, iyo irid-dhawryada, iyo reer
Netiiniim, iyo addoommada gurigan Ilaah midkoodna. 25
Oo adigoo Cesraa ahu xigmadda Ilaahaagu ku siiyey ku
dooro xaakinno iyo qaadiyo u garsoora dadka webiga ka
shisheeya oo dhan, in alla inta taqaan sharciyada Ilaahaaga,
oo kii aan aqoonna bara. 26 Oo ku alla kii aan addeecin
sharciga Ilaahaaga iyo sharciga boqorka, xukun ha lagu
soo dejiyo, iyadoo aad loogu dadaalayo, hadday tahay in
la dilo, ama in la masaafuriyo, ama in xoolihiisa lagala
wareego, amase in la xidho. 27 Waxaa ammaan leh Rabbiga
ah Ilaaha awowayaashayo, oo boqorka qalbigiisa geliyey
wax sidanoo kale ah, inuu ku qurxiyo guriga Rabbiga oo
Yeruusaalem ku yaal, 28 oo naxariis iga siiyey boqorkii, iyo
lataliyayaashiisa, iyo amiirradiisa xoogga badan hortooda
oo dhan. Oo waxaan u xoogaystay sidii gacanta Rabbiga
Ilaahayga ahu ii saarnayd, markaasaan reer binu Israa'iil ka
dhex urursaday rag madax ah inay i raacaan.

## 8

Haddaba madaxdii qabiilooyinka waa kuwan, oo kanu
waa abtirkii kuwii Baabuloon iga raacay waagii Boqor
Artaxshasta dowladnimada haystay. 2 Wiilashii Fiinexaas
waxaa ka socday Gershoom, wiilashii Iitaamaarna Daanyeel;
wiilashii Daa'uudna Xatuush, 3 oo reer Shekaanyaah ka
ahaa; wiilashii Farcoshna Sekaryaah, oo waxaa isaga la
abtirsaday boqol iyo konton nin. 4 Wiilashii Faxad Moo'aabna
waxaa ka socday Elihooceenay oo ahaa ina Seraxyaah;
oo waxaa isaga la jiray laba boqol oo nin. 5 Wiilashii
Shekaanyaahna waxaa ka socday ina Yaxasii'eel, oo waxaa
isaga la jiray saddex boqol oo nin. 6 Wiilashii Caadiinna
waxaa ka socday Cebed oo ahaa ina Yoonaataan, oo waxaa
isaga la jiray konton nin. 7 Wiilashii Ceelaamna waxaa ka
socday Yeshacyaah oo ahaa ina Catalyaah, oo waxaa isaga
la jiray toddobaatan nin. 8 Wiilashii Shefatyaahna waxaa ka
socday Sebadyaah oo ahaa ina Miikaa'eel, oo isaga waxaa
la jiray siddeetan nin. 9 Wiilashii Yoo'aabna waxaa ka socday
Cobadyaah oo ahaa ina Yexii'eel; oo waxaa isaga la jiray
laba boqol iyo siddeed iyo toban nin. 10 Wiilashii Shelomiidna
waxaa ka socday ina Yoosifyaah, oo waxaa isaga la jiray
boqol iyo lixdan nin. 11 Wiilashii Beebayna waxaa ka socday
Sekaryaah oo ahaa ina Beebay, oo waxaa isaga la jiray
siddeed iyo labaatan nin. 12 Wiilashii Casgaadna waxaa
ka socday Yooxaanaan oo ahaa ina Haqaataan, oo waxaa
isaga la jiray boqol iyo toban nin. 13 Wiilashii Adoniiqaam oo
ugu wada dambeeyeyna waxaa ka socday saddex nin, oo
waa kuwan saddexdoodii magac, Eliifeled, iyo Yecuu'eel,
iyo Shemacyaah, oo waxaa iyaga la jiray lixdan nin. 14
Wiilashii Bigwayna waxaa ka socday Cuutay iyo Sabbuud,
oo waxaa iyaga la jiray toddobaatan nin. 15 Oo iyaga waxaan
ku soo wada ururiyey webiga u socda xagga Ahawaa, oo
halkaasaannu degganayn saddex maalmood; markaasaan
dadkii iyo wadaaddadii u fiirsaday, oo halkaasna kama
aan helin mid reer Laawi ah. 16 Oo markaasaan u cid
diray Eliiceser, iyo Arii'eel, iyo Shemacyaah, iyo Elnaataan,
iyo Yaariib, iyo Elnaataan, iyo Naataan, iyo Sekaryaah,
iyo Meshullaam, oo wada ahaa rag madax ah, iyo weliba
Yooyaariib iyo Elnaataan, oo iyana ahaa macallimiin. 17
Oo waxaan iyagii u diray Iddo oo madax ka ahaa meesha
Kaasifiyaa la yidhaahdo; oo waxaan iyagii u sheegay wixii ay
ku odhan lahaayeen Iddo iyo walaalihiis oo reer Netiiniim ah
oo jooga meesha la yidhaahdo Kaasifiyaa, inay noo keenaan
midiidinno ka dhex adeega guriga Ilaahayaga. 18 Oo sidii ay

gacanta wanaagsan oo Ilaahayagu noo saarnayd, waxay
noo keeneen nin waxgarad ah oo ah reer Maxlii, oo ka ah
reer Laawi, oo ka sii ah reer binu Israa'iil, iyo Sheereebyaah,
iyo wiilashiisii iyo walaalihiis oo siddeed iyo toban isku
ahaa, 19 iyo Xashabyaah, iyo Yeshacyaah oo ahaa reer
Meraarii, iyo walaalihiis iyo wiilashoodii oo labaatan isku
ahaa, 20 iyo reer Netiiniim oo ay Daa'uud iyo amiirradiisii u
dhiibeen adeegiddii reer Laawi oo laba boqol iyo labaatan
ahaa, oo dhammaantoodna ninba magiciisii baa loogu
yeedhi jiray. 21 Oo markaasaan, intii aannu joognay Webi
Ahawaa, halkaas kaga dhawaaqay in la soomo, inaannu
isku hoosaysiinno Ilaahayaga hortiisa, inaannu ka barinno jid
toosan oo annaga iyo dhallaankayaga iyo xoolahayaga oo
dhammuba aannu marno. 22 Waayo, waxaan ka xishooday
inaan boqorka weyddiisto koox askar iyo fardooley ah inay
naga caawiyaan cadowga jidka noo jooga, maxaa yeelay,
boqorka baannu la hadallay oo ku nidhi, Gacanta Ilaahayagu
waxay saaran tahay intii isaga doondoonta oo dhan, wayna
u wanaagsan tahay; laakiinse xooggiisa iyo cadhadiisu
waxay ka gees yihiin in alla intii isaga ka tagta oo dhan.
23 Sidaas daraaddeed waannu soonnay, oo waxaannu
ka barinnay Ilaahayo wax taas ku saabsan, wuuna naga
aqbalay. 24 Markaasaan gooni u soocay laba iyo toban
nin oo wadaaddada madaxdoodii ah, oo waxay ahaayeen
Sheereebyaah iyo Xashabyaah, iyo toban iyaga la jiray oo
walaalahood ah, 25 oo waxaan u miisaamay lacagtii iyo
dahabkii iyo weelashii ahaa qurbaankii loo bixiyey guriga
Ilaah oo ay wada bixiyeen boqorkii iyo lataliyayaashiisii
iyo amiirradiisii, iyo reer binu Israa'iilkii halkaas joogay oo
dhan. 26 Waxaan iyaga u miisaamay oo gacanta u geliyey lix
boqol iyo konton talanti oo lacag ah, iyo weelal lacag ah oo
iyana boqol talanti ah, iyo boqol talanti oo dahab ah, 27 iyo
labaatan maddiibadood oo dahab ah oo iyana kun dirham
ah, iyo laba weel oo ah naxaas dhalaalaysa oo sida dahab
qaali u ah. 28 Oo markaasaan ku idhi, Idinku Rabbigaad
quduus u tihiin oo weelashuna waa quduus, oo lacagta iyo
dahabka waa qurbaan ikhtiyaar loogu bixiyey Rabbiga ah
Ilaaha awowayaashiin. 29 Haddaba idinku dhawra oo xajiya
ilaa aad ku hor miisaantaan wadaaddada sare, iyo kuwa reer
Laawi, iyo amiirrada qolooyinka reer binu Israa'iil, idinkoo
jooga qolladaha guriga Ilaah ee Yeruusaalem. 30 Sidaasay
wadaaddadii iyo kuwii reer Laawi u aqbaleen miisaankii
lacagtii iyo dahabkii iyo weelashii inay geeyaan Yeruusaalem
iyo ilaa guriga Ilaahayo. 31 Markaasaannu Webi Ahawaa
ka tagnay, oo Yeruusaalem u ambabbaxnay bishii kowaad
maalinteedii laba iyo tobnaad; oo waxaa na saarnayd gacantii
Ilaahayo, wuuna naga samatabbixiyey gacantii cadowga
iyo kuwii jidka noogu gabbanayay. 32 Oo waxaannu nimid
Yeruusaalem oo halkaasaannu intii saddex maalmood ah
iska joognay. 33 Oo maalintii afraad ayaa lacagtii iyo dahabkii
iyo weelashii lagu dhex miisaamay gurigii Ilaahayo oo waxaa
gacanta loo geliyey wadaadkii Mereemood oo ahaa ina
Uuriyaah, oo waxaa isaga la jiray Elecaasaar oo ahaa ina
Fiinexaas; oo waxaa kaloo iyaga la jiray Yoosaabaad oo
ahaa ina Yeeshuuca, iyo Noocadyaah oo ahaa ina Binnuwii
oo iyana ahaa reer Laawi; 34 oo alaabtii oo dhan waxay ku
wada guddoomeen tiro iyo miisaan, oo miisaankii oo dhanna
waagaas ayaa la wada qoray. 35 Oo dadkii maxaabiista
ahaan jiray ee masaafuriska ka soo noqday, waxay Ilaaha
reer binu Israa'iil allabaryo la gubo ugu bixiyeen laba iyo
toban dibi reer binu Israa'iil oo dhan aawadiis, iyo lix iyo
sagaashan wan, iyo toddoba iyo toddobaatan baraar ah,
iyo laba iyo toban orgi oo qurbaan dembi loo bixiyey; oo
kulli intaas oo dhammu waxay ahaayeen allabaryo la gubo
oo Rabbiga loo bixiyey. 36 Oo waxay amarkii boqorka u
geeyeen saraakiishii boqorka iyo taliyayaashii webiga ka
shisheeyey; oo iyana way taageereen dadkii iyo gurigii Ilaah.

9 Oo markii waxyaalahaas la sameeyey dabadeed waxaa
ii yimid amiirradii oo igu yidhi, Dadka reer binu
Israa'iil, iyo wadaaddadii iyo reer Laawi, gooni isagama ay
soocin dadyowgii dalka degganaa, ee waxay sameeyaan
waxyaalahooda karaahiyada ah ee ay reer Kancaan,
iyo reer Xeed, iyo reer Feris, iyo reer Yebuus, iyo reer
Cammoon, iyo reer Moo'aab, iyo Masriyiintii, iyo reer
Amor sameeyaan. 2 Waayo, iyaga iyo wiilashoodiiba
waxay guursadeen gabdhahoodii, oo sidaasuu farcankii
quduuska ahaa ugu qasmay dadyowgii dalka degganaa; oo
weliba xadgudubkaas waxaa madax u ahaa amiirrada iyo
taliyayaasha. 3 Oo kolkaan waxaas maqlay ayaan dharkaygii
iyo go'aygii jeexjeexay, oo timihii ku yiil madaxayga iyo
gadhkaygana waan iska rifay, oo waxaan fadhiistay anigoo
wareersan. 4 Markaasaa waxaa igu soo shiray in alla intii
ka cabsan jirtay erayga Ilaaha reer binu Israa'iil, dadkii
maxaabiista ka soo noqday xadgudubkoodii aawadiis; oo
anna halkaasaan iska fadhiyey tan iyo qurbaankii makhribka
anigoo wareersan. 5 Oo markii qurbaankii makhribka
la gaadhay ayaan ka kacay is-hoosaysiintaydii, iyadoo
dharkaygii iyo go'aygiiba jeexjeexan yihiin, markaasaan
jilbajoogsaday oo gacmaha u horsaday Rabbiga Ilaahayga ah;
6 kolkaasaan idhi, Ilaahayow, waan ka xishoonayaa oo waan
ka yaxyaxayaa inaan wejigayga xaggaaga u soo jeedsho,
waayo, Ilaahayow, xumaatooyinkayagii ayaa nagu batay, oo
dembilahaanshahayagiina wuxuu kor ugu baxay samooyinka.

7 Tan iyo waagii awowayaashayo iyo ilaa maantadan xujo
badan baannu lahayn, oo xumaatooyinkayagii aawadood
ayaa annaga iyo boqorradayadii iyo wadaaddadayadiiba
loogu gacangeliyey boqorradii dalalka degganaa inay seef
nala dhacaan, oo ay maxaabiis naga dhigtaan, oo ay na
dhacaan, iyo inay na wareeriyaan, siday maantadan tahay.
8 Oo hadda intii wakhti yar ah ayaa Rabbiga Ilaahayaga
ahu raalli naga noqday si qaar nooga hadhaan oo ay
u baxsadaan, iyo si uu dhidib noogu siiyo meeshiisa
quduuska ah, in Ilaahayagu indhahayaga iftiimiyo, oo uu
wakhti yar nagu soo nooleeyo addoonnimadayada. 9
Waayo, waxaannu nahay dad addoommo ah, laakiinse
Ilaahayagu naguma dayrin addoonnimadayadii, illowse
naxariis buu nagu siiyey boqorradii Faaris hortooda,
inuu na nooleeyo aawadeed, si aannu u taagno guriga
Ilaahayo, oo aannu u hagaajinno burburkiisii hore, iyo
inuu derbi naga dhex siiyo Yahuudah iyo Yeruusaalemba.
10 Haddaba Ilaahayagow, bal maxaan nidhaahnaa tan
dabadeed? Waayo, waxaannu ka tagnay amarradaadii,
11 aad noogu soo dhiibtay nebiyadii addoommadaada
ahaa, oo aad ku tidhi, Dalka aad inaad hantidaan ugu
socotaan waa dal aan nadiif ahayn, oo wuxuu ku nijaasoobay
dadyowga deggan nijaastooda, iyo karaahiyadooda, iyo
wasakhnimadooda dhammaan ka buuxsantay gees ilaa ka
gees. 12 Haddaba gabdhihiinna wiilashooda ha u guurinina,
wiilashiinnana gabdhahooda ha u guurinina, weligiinna ha
doonina nabaddooda ama barwaaqadooda, si aad xoog u
yeelataan, oo aad u cuntaan dalka wixiisa wanaagsan, oo
aad carruurtiinnana dhaxal ahaan ugaga tagtaan weligiin.
13 Oo tanu waxay noogu soo degtay falimahayagii sharka
ahaa aawadood, iyo xujadayadii weynayd aawadeed, maxaa
yeelay, Ilaahayagiiyow, waxaad nagu taqsiirtay wax ka yar
intii xumaatooyinkayagu mudnaayeen, oo weliba waxaad na
siisay dad caynkan ah oo noo hadha, 14 haddaba waxaas oo
dhan dabadeed ma mar kalaannu amarradaada jebinnaa, oo
aannu la xididnaa dadyowga karaahiyadan sameeya? Sow
noo cadhoon maysid jeeraad na wada baabbi'isid oo aadan
innaba naga reebin dad hadha iyo mid naga baxsada toona?
15 Rabbiyow, Ilaaha reer binu Israa'iilow, xaq baad tahay,
waayo, waxaannu nahay dad hadhay oo baxsaday, sida
ay maantadan tahay; bal eeg, waxaannu kula hor joognaa
xujadayada, waayo, taas aawadeed ninna hortaada ma
istaagi karo.

**10** Haddaba intii Cesraa tukanayay oo uu wax qiranayay
isagoo ooyaya oo isku tuuraya guriga Ilaah hortiisa,
waxaa isagii reer binu Israa'iil uga soo ururay shir aad u weyn
oo rag iyo dumar iyo carruurba leh, waayo, dadkii aad bay u
ooyeen. 2 Oo Shekaanyaah oo ahaa ina Yexii'eel oo ahaa
reer Ceelaam wuxuu u jawaabay Cesraa, oo ku yidhi, Annagu
waxaannu ku xadgudubnay Ilaahayo, oo naago qalaad
ayaannu ka guursannay dadyowgii dalka; laakiinse reer
binu Israa'iil weli waxay leeyihiin rajo xaalkan ku saabsan.
3 Haddaba sidaas daraaddeed aannu Ilaahayo axdi la
dhiganno innaannu iska erinno naagahaas oo dhan, iyo intii
ay dhaleenba, sidii ay tahay talada sayidkayga, iyo ta kuwa
ka gariira amarka Ilaahayo, oo sidii sharciga waafaqsan ha
loo sameeyo. 4 Haddaba kac, waayo, xaalkan adiguu ku dul
saaran yahay, oo annana waannu kula jirnaa; si wanaagsan
u dhiirranow, oo samee. 5 Markaasaa Cesraa kacay oo
wuxuu wadaaddadii sare iyo reer Laawi iyo reer binu Israa'iil
oo dhan ku wada dhaariyey inay sameeyaan sida eraygaasu
leeyahay. Oo iyana saasay ku wada dhaarteen. 6 Markaasaa
Cesraa ka kacay gurigii Ilaah hortiisa, oo wuxuu galay qolkii
Yehooxaanaan oo ahaa ina Eliyaashiib, oo markuu halkaas
yimid waxba kibis ma uu cunin, biyona ma uu cabbin,
waayo, wuxuu u baroortay xadgudubkii ay sameeyeen
dadkii maxaabiisnimada ka soo noqday. 7 Markaasay ka
dhex naadiyeen dalka reer Yahuudah iyo Yeruusaalem
oo ogeysiis gaadhsiiyeen dadkii maxaabiisnimada ka soo
noqday oo dhan inay dhammaantood Yeruusaalem ku soo
wada ururaan. 8 Oo waxay yidhaahdeen, Ku alla kii aan intii
saddex maalmood ah iman, sida ay ku taliyeen amiirrada iyo
odayaashu, maalkiisa oo dhan waa laga xaaraamayn doonaa,
oo isaga qudhiisana gooni baa looga sooci doonaa ururka
dadkii maxaabiisnimada ka soo noqday. 9 Markaasaa raggii
reer Yahuudah iyo reer Benyaamiin oo dhammu intii saddex
maalmood ah ku soo wada urureen Yeruusaalem, oo taasu
waxay ahayd bishii sagaalaad maalinteedii labaatanaad,
kolkaasaa dadkii oo dhammu wuxuu fadhiistay bannaankii
guriga Ilaah hortiisa ahaa, iyagoo gariiraya xaalkan aawadiis
iyo roobkii weynaa daraaddiis. 10 Markaasaa waxaa istaagay
wadaadkii Cesraa ahaa oo wuxuu dadkii ku yidhi, Idinku
waad xadgudubteen oo waxaad guursateen naago qalaad,
oo sidaasaad reer binu Israa'iil xujada ugu sii kordhiseen. 11
Haddaba sidaas daraaddeed dembigiinna u qirta Rabbiga
ah Ilaahii awowayaashiin, oo sameeya wax isaga ka farxiya;
oo gooni isaga sooca dadyowga dalka deggan, iyo naagaha
qalaadba. 12 Markaasaa ururkii oo dhammu isku mar
jawaabeen oo cod dheer ku yidhaahdeen, Waa inaannu
samaynaa sidaad xaalkayaga ka tidhi. 13 Laakiinse dadku
wuu badan yahay, oo wakhtiganna waxaa jira roob badan,
oo annana dibadda ma taagnaan karno, tanuna ma aha
shuqul lagu qaban karo maalin iyo laba toona, waayo,

annagu xaalkan aad baannu ugu xadgudubnay. 14 Haddaba amiirradayadu ururka oo dhan ha isu taageen oo kulli inta naagaha qalaad guursatay oo magaalooyinkayaga jooga oo dhammu wakhti la ballamay ha yimaadeen, oo iyaga ha soo raaceen magaalo kasta odayaasheeda iyo xaakinnadeedu, jeeray cadhada kulul oo Ilaahayo ee xaalkan ku saabsan naga rogmato. 15 Laakiinse xaalkan waxaa keliyahu hor istaagay Yoonaataan ina Casaaheel iyo Yaxaasyaah ina Tiqwaah; waxaana caawiyey Meshullaam iyo Shabbetay oo ahaa reer Laawi. 16 Oo dadkii maxaabiisnimada ka soo noqdayna saasay yeeleen. Oo waxaa gooni ahaan loo soocay wadaadkii Cesraa ahaa, iyo kuwo madax ah oo ka socda qolooyinkoodii, oo kulligoodna magacyadooda loogu wada yeedhay, oo iyana bishii tobnaad maalinteedii kowaad ayay u fadhiisteen inay xaalkan soo baadhaan. 17 Oo waxay xaalka ku saabsan raggii naagaha qalaad guursaday oo dhan dhammeeyeen bishii kowaad maalinteedii kowaad. 18 Oo wiilashii wadaaddada waxaa laga dhex helay kuwo naago qalaad guursaday; waxayna ahaayeen wiilashii Yeeshuuca, ina Yoosaadaaq iyo walaalihiis oo ahaa Macaseeyaah, iyo Eliiceser, iyo Yaariib iyo Gedalyaah. 19 Oo iyana waxay gacantooda ku dhiibeen oo ku ballanqaadeen inay naagahooda eryaan, oo iyagoo xujo leh waxay xujadooda ugu bixiyeen wan idaha laga soo qabtay. 20 Wiilashii Immeerna waxaa laga helay Xanaanii iyo Sebadyaah. 21 Wiilashii Xaarimna, Macaseeyaah, iyo Eliiyaah, iyo Shemacyaah, iyo Yexii'eel, iyo Cusiyaah. 22 Wiilashii Fashxuurna, Eliyooceenay, iyo Macaseeyaah, iyo Ismaaciil, iyo Netaneel, iyo Yoosaabaad, iyo Elcaasaah. 23 Oo reer Laawina, Yoosaabaad, iyo Shimcii, iyo Qeelaayaah (kaasu waa Qeliitaa), iyo Fetaxyaah, iyo Yahuudah, iyo Eliiceser. 24 Raggii gabayaaga ahaana waxaa laga helay Eliyaashiib; irid-dhawryadiina waxaa laga helay Shalluum, iyo Telem, iyo Uurii. 25 Oo reer binu Israa'iilna waxaa laga helay wiilashii Farcosh oo ahaa Ramyaah, iyo Yisyaah, iyo Malkiiyaah, iyo Miyaamin, iyo Elecaasaar, iyo Malkiiyaah, iyo Benaayaah. 26 Wiilashii Ceelaamna, Matanyaah, iyo Sekaryaah, iyo Yexii'eel, iyo Cabdii, iyo Yereemood, iyo Eliiyaah. 27 Wiilashii Satuuna, Eliyooceenay, iyo Eliyaashiib, iyo Matanyaah, iyo Yereemood, iyo Saabaad, iyo Casiisaa. 28 Wiilashii Beebayna, Yehooxaanaan, iyo Xananyaah, iyo Sabbay, iyo Catlay. 29 Wiilashii Baaniina, Meshullaam, iyo Malluug, iyo Cadaayaah, iyo Yaashuub, iyo She'aal, iyo Yereemood. 30 Wiilashii Faxad Moo'aabna, Cadnaa, iyo Kelaal, iyo Benaayaah, iyo Macaseeyaah, iyo Matanyaah, iyo Besaleel, iyo Binnuwii, iyo Manaseh. 31 Wiilashii Haarimna, Eliiceser, iyo Yishiyaah, iyo Malkiiyaah, iyo Shemacyaah, iyo Shimcoon, 32 Benyaamiin, iyo Malluug, iyo Shemaryaah. 33 Wiilashii Xaashumna, Matenay, iyo Matataah, iyo Saabaad, iyo Eliifeled, iyo Yereemay, iyo Manaseh, iyo Shimcii. 34 Wiilashii Baaniina, Macaday, iyo Camraam, iyo Uu'eel, 35 iyo Benaayaah, iyo Beedyaah, iyo Keluux, 36 iyo Wanyaah, iyo Mereemood, iyo Eliyaashiib, 37 iyo Matanyaah, iyo Matenay, iyo Yacasay, 38 iyo Baanii, iyo Binnuwii, iyo Shimcii, 39 iyo Shelemyaah, iyo Naataan, iyo Cadaayaah, 40 Maknadbay, iyo Shaashay, iyo Shaaray, 41 iyo Casareel, iyo Shelemyaah, iyo Shemaryaah, 42 iyo Shalluum, iyo Amaryaah, iyo Yuusuf. 43 Wiilashii Nebona, Yecii'eel, iyo Matityaah, iyo Saabaad, iyo Sebiinaa, iyo Iddo, iyo Yoo'eel, iyo Benaayaah. 44 Oo kulli intaasoo dhammu waxay wada guursadeen naago qalaad, oo qaarkood waxay qabeen naago ay carruur ka dhaleen.

# Nexemyaah

1 Kanu waa hadalkii Nexemyaah oo ahaa ina Xakalyaah.
Hadda intaan joogay Shuushan oo ah hoygii boqorka,
sannaddii labaatanaad bisheedii Kislee'u, 2 waxaa yimid
Xanaanii oo walaalahayga midkood ahaa, isaga iyo niman
kale oo dalka Yahuudah ka yimid; oo markaasaan weyddiiyey
wax ku saabsan Yuhuuddii baxsatay, oo maxaabiistii ka
hadhay, iyo wax ku saabsan Yeruusaalem. 3 Oo iyana waxay
igu yidhaahdeen, Kuwii maxaabiista ka hadhay oo gobolkii
jira waxay ku jiraan dhibaato weyn iyo ceeb; oo derbigii
Yeruusaalemna waa la dumiyey, oo irdaheediina dab baa
lagu gubay. 4 Oo markaan erayadaas maqlay ayaan meel
fadhiistay oo ooyay, oo intii ayaamo ah ayaan baroortay;
waanan soomay, oo waxaan ku tukaday Ilaaha samada
hortiisa, 5 oo idhi, Rabbiyow, Ilaaha samadow, Ilaaha weyn
oo laga cabsadow, oo axdiga xajiya, oo u naxariista kuwa
isaga jecel oo amarradiisa xajiyow, waan ku baryayaaye, 6
Dhegahaagu ha maqleen, indhahaagana fur, inaad maqashid
baryadayda anoo addoonkaaga ah. Wakhtigan habeen
iyo maalinba waxaan kuu baryayaa reer binu Israa'iil oo
addoommadaada ah, anigoo qiraya dembiyadii aan aniga
iyo reer binu Israa'iil kugu dembaabnay; haah, aniga iyo
reerka aabbahayba waannu dembaabnay. 7 Oo si aad u
xun ayaannu kula macaamiloonnay, oo ma aannan xajin
amarradii, iyo qaynuunnadii, iyo xukummadii aad ku amartay
addoonkaagii Muuse ahaa. 8 Waan ku baryayaaye, bal
xusuuso eraygii aad ku amartay addoonkaagii Muuse ahaa,
oo aad ku tidhi, Haddaad xadgudubtaan, waxaan idinku kala
dhex firdhin doonaa dadyowga, 9 laakiinse haddaad ii soo
noqotaan oo aad amarradayda xajisaan oo aad yeeshaan, in
kastoo kuwiinna la tuuray ay joogaan meesha samada ugu
fog, halkaasaan ka soo ururin doonaa, oo waxaan keeni
doonaa meeshii aan u doortay inaan ka dhigo in magacaygu
joogo. 10 Haddaba kuwanu waa addoommadaada iyo
dadkaaga aad ku soo furtay xooggaagii iyo gacantaadii
xoogga badnayd. 11 Sayidow, waan ku baryayaaye, hadda
dhegahaagu ha maqleen baryadayda anoo addoonkaaga ah,
iyo baryada addoommadaada ku farxa inay ka cabsadaan
magacaaga; waan ku baryayaaye, maanta i guulee, anoo
addoonkaaga ah, oo ka dhig inaan ninkan hortiisa naxariis
ka helo. (Anigu waxaan ahaa koobsidaha boqorka.)

2 Bishii Niisaan oo ahayd sannaddii labaatanaad oo boqor
Artaxshasta, iyadoo khamri hor yaal isaga ayaan khamrigii
qaaday oo boqorkii siiyey. Hadda ka hor anigu boqorka
hortiisa caloolxumo kuma joogi jirin. 2 Oo boqorkii wuxuu igu
yidhi, War maxaa wejigaagu u murugaysan yahay adigoo
aan bukayn? Tanu wax kale ma aha waase tiiraanyo qalbiga
ku jirta. Markaasaan aad u baqay, 3 oo waxaan boqorkii
ku idhi, Boqorow, weligaaba noolow. Bal maxaa wejigaygu
la murugaysnaan waayay, iyadoo magaalada ah meeshii
awowayaashay xabaalahoodu ahaayeen ay baabba' tahay,
oo irdaheediina dab lagu gubay? 4 Markaasaa boqorkii
wuxuu igu yidhi, Hadda maxaad iga baryaysaa? Kolkaasaan
Ilaaha samada baryay. 5 Oo waxaan boqorkii ku idhi,
Boqorow, hadday ku farxiso, oo haddaad raalli iga tahay
anoo addoonkaaga ah, waxaan doonayaa inaad ii dirtid
dalka Yahuudah oo ay ku taal magaalada awowayaashay
xabaalahoodu yihiin, inaan dhiso. 6 Kolkaasaa boqorkii
wuxuu igu yidhi, (iyadoo boqoraddiina agtiisa fadhido)
Sodcaalkaagu tan iyo goormuu ahaanayaa? Goormaadse
soo noqonaysaa? Markaasuu boqorku ku farxay inuu i diro;
oo waxaan u qabtay wakhti. 7 Oo weliba waxaan boqorkii ku
idhi, Boqorow, haddaad raalli ka tahay, ha lay siiyo warqado
aan u geeyo taliyayaasha webiga ka shisheeya, si ay igu
oggolaadaan inaan dhex maro dalkooda ilaa aan gaadho
dalka Yahuudah; 8 iyo warqad kaloo aan siiyo Aasaaf oo
ah kan dhawra dhirta boqorka, si uu ii siiyo alwaax aan ku
sameeyo waxa haya saqafka irdaha qalcadda ee guriga u
dhow, iyo derbiga magaalada iyo guriga aan geli doono.
Oo boqorkiina wuu ii wada oggolaaday sidii ay gacantii
wanaagsanayd ee Ilaahay ii saarnayd. 9 Markaasaan u imid
taliyayaashii webiga ka shisheeyey, oo iyagii siiyey warqadihii
boqorka. Oo weliba waxaa boqorku igu daray saraakiil
ciidanka ka tirsan iyo fardooley. 10 Oo Sanballad oo ahaa reer
Xoron, iyo addoonkii ahaa Toobiyaah oo ahaa reer Cammoon
markay maqleen inuu yimid nin doonaya wanaagga reer binu
Israa'iil ayay aad iyo aad u murugoodeen. 11 Markaasaan
Yeruusaalem imid, oo halkaasaan saddex maalmood iska
joogay. 12 Oo habeennimadii ayaan kacay, anigoo ay dhawr
nin ila socdaan, oo ninna uma aan sheegin waxa Ilaahay
qalbigayga geliyey inaan Yeruusaalem u sameeyo. Oo
neefna ilama jirin neefkii aan fuushanaa mooyaane. 13
Oo habeennimo ayaan ka baxay Iriddii Dooxada, oo ku
tiil xagga Ceelkii Maska, oo waxaan maray xagga Iriddii
Digada, waanan fiiriyey derbiyadii Yeruusaalem oo wada
dunsanaa, iyo irdaheedii dabka lagu gubay. 14 Oo haddana
waxaan tegey Iriddii Isha biyaha iyo xaggii Balligii Boqorka;
laakiinse neefkii aan fuushanaa meeluu maro ma jirin. 15 Oo
haddana waxaan habeennimo tegey xaggii durdurka, oo
derbigii baan fiiriyey, kolkaasaan dib u noqday, oo magaaladii
ka soo galay xaggii Iriddii Dooxada, oo saasaan u soo
noqday. 16 Oo taliyayaashiina ma ay ogayn meel aan tegey

iyo wixii aan sameeyey toona; oo weli waxba uma aan
sheegin Yuhuuddii, iyo wadaaddadii, iyo kuwii gobta ahaa,
iyo taliyayaashii, iyo intii kaloo shuqulka samaysay toona.
17 Markaasaan ku idhi, War waad aragtaan xaalka xun
oo aan ku jirno, iyo sida Yeruusaalem u baabba'day, iyo
in irdaheedii dab lagu gubay. Haddaba kaalaya oo aan
dhisno derbiga Yeruusaalem, si aynaan mar dambe u sii
ceebaysnaan. 18 Oo waxaan iyagii wax uga sheegay gacantii
Ilaahay oo korkayga ku wanaagsanayd, iyo weliba erayadii
uu boqorku igula hadlay. Oo iyana waxay yidhaahdeen,
Ina kiciya aan dhisnee. Sidaasay gacmahoodii shuqulkii
wanaagsanaa ugu xoogeeyeen. 19 Laakiinse Sanballad oo
ahaa reer Xoron, iyo addoonkii ahaa Toobiyaah oo ahaa
reer Cammoon, iyo Geshem oo ahaa Carab, markay taas
maqleen ayay nagu qosleen, oo na quudhsadeen, oo waxay
yidhaahdeen, War waxaad samaynaysaan waa maxay? Ma
boqorkaad ku caasiyoobaysaan? 20 Markaasaan jawaabay
oo ku idhi, Ilaaha samadu wuu na liibaanin doonnaa, oo
sidaas daraaddeed annagoo addoommadiisa ah waannu kici
doonnaa, wax baannuna dhisi doonnaa, laakiinse idinku
Yeruusaalem kuma lihidin qayb, ama xaq, amase xusuus
toona.

**3** Markaasaa Eliyaashiib oo ahaa wadaadkii sare ayaa la
kacay wadaaddadii walaalihiis ahaa, oo waxay dhiseen
Iriddii Idaha, oo intay quduus ka dhigeen ayay albaabbadeedii
qotomiyeen, oo waxay quduus ka dhigeen tan iyo Munaaraddii
Mee'aah iyo ilaa Munaaraddii Xananeel. 2 Oo intii isaga
ku xigtayna waxaa dhisay dadkii Yerixoo, oo intii iyaga ku
xigtayna waxaa dhisay Sakuur ina Imrii. 3 Iriddii Kalluunkana
waxaa dhisay reer Hasenaa'aah, oo waxay saareen alwaaxdii
saqafka haysay, wayna taageen albaabbadeedii oo geliyeen
handarraabbadeedii iyo qataarradeedii. 4 Oo intii iyaga ku
xigtayna waxaa cusboonaysiiyey Mereemood ina Uuriyaah,
oo ahaa reer Xaqoos. Oo intii iyaga ku xigtayna waxaa
cusboonaysiiyey Meshullaam ina Berekyaah oo ahaa
ina Mesheysabeel. Oo intii iyaga ku xigtayna waxaa
cusboonaysiiyey Saadooq ina Bacanaa. 5 Oo meeshii
iyaga ku xigtayna waxaa cusboonaysiiyey reer Teqooca,
laakiinse kuwoodii gobta ahaa waxba kama qaban shuqulkii
sayidkooda. 6 Iriddii Gabowdayna waxaa cusboonaysiiyey
Yooyaadaac oo ahaa ina Faasee'ax iyo Meshullaam
oo ahaa ina Besoodyaah, oo waxay saareen alwaaxdii
saqafka haysay, wayna taageen albaabbadeedii oo geliyeen
handarraabbadeedii iyo qataarradeedii. 7 Oo meeshii iyaga
ku xigtayna waxaa cusboonaysiiyey Melatyaah oo ahaa
reer Gibecoon, iyo Yaadoon oo ahaa reer Meeronotii, iyo
dadkii reer Gibecoon, iyo kuwii reer Misfaah, oo ku hoos jiray
carshiga taliyaha webiga ka shisheeya. 8 Oo meeshii isaga
ku xigtayna waxaa cusboonaysiiyey Cusii'eel oo ahaa ina
Xarhayaah oo ka mid ahaa dahabtumayaashii. Oo meeshii
isaga ku xigtayna waxaa cusboonaysiiyey Xananyaah oo
ka mid ahaa dawosameeyayaashii, oo waxay Yeruusaalem
adkeeyeen tan iyo derbiga ballaadhan. 9 Oo meeshii iyaga
ku xigtayna waxaa cusboonaysiiyey Refaayaah oo ahaa ina
Xuur oo ahaa taliyihii degmada Yeruu saalem badhkiis. 10
Oo meeshii iyaga ku xigtay oo ka soo hor jeedday gurigiisa
waxaa cusboonaysiiyey Yedacyaah oo ahaa ina Xaruumaf.
Meeshii isaga ku xigtayna waxaa dhisay Xatuush oo ahaa
ina Xashabneyaah. 11 Malkiiyaah ina Xaarim iyo Xashuub
ina Faxad Moo'aabna waxay cusboonaysiiyeen meel kale
iyo Munaaraddii Foornooyinka. 12 Oo meeshii isaga ku
xigtayna waxaa cusboonaysiiyey Shalluum ina Hallooxeesh
oo ahaa taliyihii dhistariga Yeruusaalem badhkiis, isagii iyo
gabdhihiisii. 13 Iriddii Dooxadana waxaa cusboonaysiiyey
Xaanuun iyo dadkii Saanoo'ax degganaa. Iyagu way
dhiseen, oo waxay qotomiyeen albaabbadeedii oo geliyeen
handarraabbadeedii iyo qataarradeedii, oo waxay dhiseen
kun dhudhun oo derbigii ah tan iyo Iriddii Digada. 14 Iriddii
Digadana waxaa cusboonaysiiyey Malkiiyaah ina Reekaab
oo ahaa taliyihii degmada Beyd Hakerem; wuu dhisay, wuuna
qotomiyey albaabbadeedii oo geliyey handarraabbadeedii
iyo qataarradeedii. 15 Iriddii Isha biyaha ahna waxaa
cusboonaysiiyey Shalluun ina Kaalxoseh oo ahaa taliyihii
degmada Misfaah, wuu dhisay oo deday, oo wuxuu
qotomiyey albaabbadeedii oo geliyey handarraabbadeedii iyo
qataarradeedii, oo derbigii Warta Shelax oo beerta boqorka
u dhowaana wuu dhisay, oo wuxuu gaadhsiiyey tan iyo
jaranjarada hoos uga degata magaalada Daa'uud. 16 Meeshii
isaga ku xigtayna waxaa cusboonaysiiyey Nexemyaah ina
Casbuuq oo ahaa taliyihii degmada Beytsuur badhkiis, oo
isagu wuxuu dhisay tan iyo meesha ka soo hor jeedda
xabaalihii Daa'uud, iyo tan iyo balligii la sameeyey, iyo tan
iyo gurigii ragga xoogga badan. 17 Meeshii isaga ku xigtayna
waxaa cusboonaysiiyey reer Laawi oo Rexuum ina Baanii ka
mid ahaa. Meeshii isaga ku xigtayna waxaa cusboonaysiiyey
Xashabyaah oo ahaa taliyihii degmada Qeciilaah badhkiis
oo degmadiisa aawadiis ayuu u dhisay. 18 Meeshii isaga
ku xigtayna waxaa cusboonaysiiyey walaalahood oo uu
ka mid ahaa Baway ina Xeenaadaad oo ahaa taliyihii
degmada Qeciilaah badhkiis. 19 Meel kale oo isaga ku
xigtayna waxaa cusboonaysiiyey Ceser ina Yeeshuuca
oo ahaa taliyihii Misfaah, taas oo ahayd meel ka soo
hor jeedda meesha loo fuulo maqsinka hubka oo ku ag

yiil meeshuu derbigu ka leexdo. **20** Meel kale oo isaga
ku xigtayna waxaa dadaal ku cusboonaysiiyey Baaruug
ina Sabbay, tan iyo leexashada derbiga iyo ilaa albaabkii
guriga Eliyaashiib oo ahaa wadaadka sare. **21** Meel kale oo
isaga ku xigtayna waxaa cusboonaysiiyey Mereemood ina
Uuriyaah oo ahaa reer Xaqoos, tan iyo guriga Eliyaashiib
albaabkiisa iyo ilaa guriga Eliyaashiib dabadiisa. **22** Meeshii
isaga ku xigtayna waxaa cusboonaysiiyey wadaaddadii
ahaa dadkii Bannaanka. **23** Meeshii iyaga ku xigtayna
waxaa cusboonaysiiyey Benyaamiin iyo Xashuub taas
oo ahayd meel guryahooda ka soo hor jeedday. Meeshii
iyaga ku xigtayna waxaa cusboonaysiiyey Casaryaah ina
Macaseeyaah oo ahaa reer Cananyaah, taas oo ahayd
gurigiisa dhinaciisa. **24** Meel kale oo isaga ku xigtayna
waxaa cusboonaysiiyey Binnuwii ina Xeenaadaad, taas oo
ka bilaabmaysay gurigii Casaryaah ilaa meeshuu derbigu ka
leexdo iyo tan iyo derbiga geeskiisii. **25** Faalaal ina Uusayna
wuxuu cusboonaysiiyey meel leexashadii derbiga ka soo hor
jeedday iyo munaaraddii ka taagnayd gurigii boqorka oo sare
ee u dhowaa barxaddii waardiyayaasha, oo meeshii isaga
ku xigtayna waxaa cusboonaysiiyey Fedaayaah ina Farcosh.
**26** (Haddaba reer Netiiniim waxay degganaayeen Cofel iyo
tan iyo meel ka soo hor jeedday Iridda Biyaha oo xagga bari,
iyo ilaa munaaraddii kor u taagnayd.) **27** Meel kale oo isaga
ku xigtayna waxaa cusboonaysiiyey reer Teqooca, taasoo ka
soo hor jeedday munaaraddii weynayd oo kor u taagnayd,
iyo tan iyo derbigii Cofel. **28** Iriddii Faraska korkeedana
waxaa cusboonaysiiyey wadaaddadii, oo mid waluba wuxuu
sameeyey meeshii gurigiisa ka soo hor jeedday. **29** Meeshii
isaga ku xigtayna waxaa cusboonaysiiyey Saadooq ina
Immeer, taasoo ahayd meel gurigiisa ka soo hor jeedday.
Meel kale oo isaga ku xigtayna waxaa cusboonaysiiyey
Shemacyaah ina Shekaanyaah oo ahaa kii dhawri jiray
Iridda Bari. **30** Meel kale oo isaga ku xigtayna waxaa
cusboonaysiiyey Xananyaah ina Shelemyaah iyo Xaanuun
oo ahaa Saalaaf wiilkiisii lixaad. Meeshii isaga ku xigtayna
waxaa cusboonaysiiyey Meshullaam ina Berekyaah, taasoo
ahayd meel qolkiisii ka soo hor jeedday. **31** Meeshii isaga
ku xigtayna waxaa cusboonaysiiyey Malkiiyaah oo ahaa
dahabtumayaasha midkood oo wuxuu dhisay tan iyo gurigii
reer Netiiniim iyo baayacmushtariyada oo ka soo hor
jeedday Iridda Mifqaad iyo ilaa meeshii geeska laga fuulo.
**32** Oo meeshii geeska laga fuulo iyo Iriddii Idaha intii u
dhaxaysayna waxaa cusboonaysiiyey dahabtumayaashii iyo
baayacmushtariyadii.

**4** Laakiinse markii Sanballad maqlay inaannu derbigii
dhisaynay ayuu cadhooday, oo aad u dhirfay, oo
Yuhuuddiina wuu ku majaajilooday. **2** Markaasuu ka hor
hadlay walaalihiis iyo ciidankii Samaariya, oo wuxuu yidhi,
War Yuhuuddan itaalka daranu waxay samaynayaan waa
maxay? Iyaga ma la daynayaa? Oo miyey allabaryayaan? Oo
ma maalin bay hawshaas ku dhammaynayaan? Oo dhagxantii
miyey ka soo noolaynayaan tuulmooyinkii waxyaalaha
baabba'ay oo gubtay? **3** Oo haddana Toobiyaah oo ahaa
reer Cammoon oo agtiisa taagnaa wuxuu yidhi, Waxa ay
dhisayaan oo dhan xataa haddii dawaco fuusho way kala
burburinaysaa derbigooda dhagaxa ah. **4** Ilaahayagow,
bal maqal, waayo, waa nala quudhsadaye; caydooda dib
ugu celi madaxooda, oo iyaga u gacangeli dal dhaca oo
maxaabiis ahaan u kaxaysta. **5** Oo xumaantoodana ha
dedin, oo dembigoodana yaan hortaada laga tirtirin, waayo,
kuwii wax dhisayay hortooda ayay kaaga xanaajiyeen. **6**
Haddaba derbigii waannu dhisnay; oo derbigii oo dhan waa
lays qabadsiiyey ilaa qotonkiisii badhkiis la gaadhsiiyey,
waayo dadku waxay maanka ku hayeen inay shaqeeyaan. **7**
Laakiinse markii Sanballad, iyo Toobiyaah, iyo kuwii Carbeed,
iyo reer Cammoon, iyo reer Ashdood ay maqleen in derbiyadii
Yeruusaalem cusboonaysiintoodii ay hore u socotay iyo in la
bilaabay in daldaloolladii la fureeyo ayay aad u cadhoodeen.
**8** Markaasay dhammaantood shirqool ku wada arrinsadeen
inay soo kacaan oo Yeruusaalem la diriraan, iyo inay
dhexdeeda qas ka ridaan. **9** Laakiinse waxaannu barinnay
Ilaahayo, oo iyaga aawadood ayaannu yeelnay waardiyayaal
naga ilaaliya habeen iyo maalinba. **10** Markaasaa dadkii
dalka Yahuudah waxay yidhaahdeen, Kuwa culaysyada
qaada xooggoodii waa yaraaday, oo waxaa jira waxyaalo
dundumay oo badan, sidaa daraaddeed derbiga ma dhisi
karno. **11** Oo cadaawayaashayadiina waxay yidhaahdeen,
Iyagu ma ay ogaan doonaan, mana ay arki doonaan jeeraan
dhex tagno oo aan iyaga layno, oo shuqulkana aan joojinno.
**12** Oo markii Yuhuuddii iyaga ag degganayd ay yimaadeen,
waxay toban jeer nagu yidhaahdeen, Idinku waa inaad meel
walba nooga soo noqotaan. **13** Haddaba sidaas daraaddeed
meeshii ugu hoosaysay oo derbiga ka dambaysay oo
meelaha bannaan ku yiil ayaan taagay dadkii qoloqolo u
safan oo wada haysta seefahoodii, iyo warmahoodii, iyo
qaansooyinkoodiiba. **14** Oo intaan wax fiiriyey ayaan kacay
oo waxaan ku idhi kuwii gobta ahaa, iyo taliyayaashii, iyo
dadka intiisii kaleba, Iyaga ha ka cabsanina, ee waxaad
xusuusataan Sayidka weyn oo laga cabsado, oo waxaad
u dirirtaan walaalihiin, iyo wiilashiinna, iyo gabdhihiinna,
iyo naagihiinna, iyo guryihiinnaba. **15** Haddaba markii

cadaawayaashayadii ay maqleen inaannu taas ogaannay,
oo uu Ilaah taladoodii kala riday, ayaannu kulligayo ku
noqonnay derbigii oo mid waluba wuxuu qabtay shuqulkiisii.
16 Oo intii markaas ka dambaysay midiidinnadaydii badhkood
shuqulkii bay sameeyeen, oo badhkoodii kalena waxay
hayeen warmihii, iyo gaashaammadii, iyo qaansooyinkii, iyo
jubbado bir ah, oo taliyayaashii oo dhammuna way daba
taagnaayeen dadkii dalka Yahuudah oo dhan. 17 Oo kuwii
derbiga dhisayay iyo kuwii wax culus isa saarayba mid
waluba gacmihiisa middood wuxuu ku sameeyey shuqulkii,
midda kale wuxuu ku haystay hubkiisii dagaalka. 18 Oo
kuwii wax dhisayayna mid walba seeftiisu dhinaca ayay ugu
xidhnayd, oo sidaasayna wax u dhisayeen. Oo kii buunka
yeedhin jirayna aniguu i ag joogay. 19 Oo waxaan ku idhi
kuwii gobta ahaa, iyo taliyayaashii, iyo dadka intiisii kaleba,
Shuqulku waa weyn yahay, wuuna ballaadhan yahay, annana
derbiga dushiisa waannu ku kala firidhsan nahay, oo midba
midka kale wuu ka fog yahay. 20 Meel alla meeshii aad ka
maqashaan dhawaaqa buunka, halkaas noogu soo urura;
waxaa inoo diriri doona Ilaaheenna. 21 Sidaasaannu shuqulkii
u qabannay; oo dadka badhkiisna waxay warmaha haysteen
markii waagu beryay iyo tan iyo jeeray xiddiguhu muuqdeen.
22 Oo sidaas oo kale isla markaas waxaan dadkii ku idhi,
Mid kasta iyo midiidinkiisu ha ku soo hoydeen Yeruusaalem,
si ay habeenkii waardiyayaal noogu noqdaan, maalintiina
ay u hawshoodaan. 23 Haddaba sidaas daraaddeed aniga
iyo walaalahay, iyo midiidinnadaydii, iyo raggii waardiyaha
ahaa oo i daba socday toona midkayana dharkiisii iskama
furin, oo mid kastaaba isagoo hubkiisii u xidhan yahay ayaa
biyaha xaggooda tegey.

**5** Markaasaa waxaa dadkii iyo afooyinkooda ka kacay qaylo
weyn oo ay kaga cabanayeen walaalahooda Yuhuudda
ah. 2 Oo waxaa jiray dad yidhi, Annaga iyo wiilashayada
iyo gabdhahayagu waannu badan nahay, haddaba aan
hadhuudh helno si aannu u cunno oo ugu noolaanno. 3
Oo weliba waxaa kaloo jiray qaar yidhi, Annagu waxaannu
rahaamad u dhiibaynaa beerahayaga iyo beerahayaga
canabka ah iyo guryahayaga, si aannu u helno hadhuudh
abaarta aawadeed. 4 Oo waxaa kaloo jiray kuwo yidhi,
Gabbaradii uu boqorku ka doonayay beerahayagii iyo
beerahayagii canabka ahaa ayaannu lacag u amaahannay.
5 Haddaba jiidhkayagu waa sida jiidhka walaalahayo, oo
carruurtayaduna waa sida carruurtooda oo kale, oo bal
eeg, wiilashayadii iyo gabdhahayagii ayaannu u bixinaynaa
inay addoommo noqdaan, oo gabdhahayagii qaarkood mar
horaa la addoonsaday; oo annana ma lihin itaal aan wax
kaga tarno, waayo, dad kalaa wada haysta beerahayagii
iyo beerahayagii canabka ahaa oo dhan. 6 Oo anna aad
baan u cadhooday markii aan maqlay qayladoodii iyo
erayadan. 7 Markaasaan isla arrinsaday, waanan la diriray
kuwii gobta ahaa iyo taliyayaashii, oo waxaan ku idhi,
Idinka mid waluba wuxuu walaalkiis ka qaataa korsocod.
Oo anigu waxaan qabtay shir weyn oo iyaga ka gees ah. 8
Oo waxaan ku idhi, Innagu walaalaheennii Yuhuudda ahaa
oo quruumaha laga iibiyey, waan soo furannay intii aan
awoodnay oo dhan, haddaba idinku ma waxaad doonaysaan
inaad walaalihiin iibisaan? Oo ma annagaa nalaga iibinayaa?
Markaasay shib iska yidhaahdeen oo eray ay ku hadlaan
way garan waayeen. 9 Oo weliba waxaan idhi, War waxaad
samaysaan ma wanaagsana. Sow waajib idinkuma aha inaad
ku socotaan ka cabsashada Ilaaheenna cayda quruumaha
cadaawayaasheenna ah aawadeed? 10 Oo sidaasoo kale
aniga iyo walaalahay iyo midiidinnadayda lacag iyo hadhuudh
baan korsocod ku amaahinnaa. Waan idin baryayaaye
aan iska dayno korsocodkan. 11 Haddaba waxaan idinka
baryayaa inaad maantadan u celisaan beerahoodii, iyo
beerahoodii canabka ahaa, iyo beerahoodii saytuunka ahaa,
iyo guryahoodii, oo lacagtii, iyo hadhuudhkii, iyo khamrigii,
iyo saliiddii aad korsocodka uga qaadateenna boqolkii
meelood meel u celiya. 12 Markaasay yidhaahdeen, Waxoodii
waan u celinaynaa, oo wax dambena weyddiisan mayno
innaba. Waxaannu yeelaynaa sidaad tidhaahdo. Markaasaan
u yeedhay wadaaddadii, oo waxaan ku dhaariyey inay
ballankan siduu yahay oofiyaan. 13 Markaasaan maradii
dhabtayda hurgufay oo waxaan idhi, Ilaahay sidaas ha
uga hurgufo gurigiisa iyo hawshiisa nin alla ninkii aan
oofin ballankan; sidaas oo kale isaga ha loo hurgufo oo
ha loo madhiyo. Markaasaa ururkii oo dhammu waxay
yidhaahdeen, Aamiin, Rabbigana way ammaaneen. Oo
dadkiina way sameeyeen sidii ballankaasu ahaa. 14 Oo
weliba tan iyo waagii la ii doortay inaan taliye u ahaado dalka
Yahuudah waagaasoo ahaa boqorkii Artaxshasta sannaddiisii
labaatanaad ilaa tan iyo sannaddiisii laba iyo soddonaad
inta u dhex leh intaasoo ahayd laba iyo toban sannadood,
aniga iyo walaalahay midna ma cunin cuntadii taliyaha.
15 Laakiinse taliyayaashii hore oo iga sii horreeyey dadka
culays bay ku hayeen, oo waxay ka qaadan jireen cunto
iyo khamri iyo weliba afartan sheqel oo lacag ah, oo xataa
midiidinnadoodu dadka way xukumi jireen. Laakiinse anigu
saas ma aan yeelin, maxaa yeelay, waxaan ka cabsadaa
Ilaah. 16 Oo weliba waxaan hore u sii waday shuqulkii
derbigan, oo annagu waxba dhul ma aannu iibsan. Oo
midiidinnadaydii oo dhammuna halkaasay shuqulka aawadiis

ku soo wada urureen. 17 Oo weliba waxaa miiskayga wax ka
cuni jiray boqol iyo konton nin oo ah Yuhuud iyo taliyayaal oo
ayan ku jirin kuwii nooga yimid quruumihii hareerahayaga ku
wareegsanaa. 18 Haddaba maalintiiba waxaa naloo diyaarin
jiray dibi iyo lix neef oo wanaagsan oo ido ah; oo weliba
waxaa la ii diyaarin jiray digaag, oo tobankii maalmoodba
mar baa naloo keeni jiray cayn kasta oo khamri ah; oo
weliba intaas oo dhan anigu marna ma weyddiisan cuntadii
taliyaha, maxaa yeelay, addoonnimada dadkan saarnayd
aad bay u cuslayd. 19 Ilaahayow, wanaag igu xusuuso wixii
aan dadkan u sameeyey oo dhan aawadiis.

6 Haddaba markii Sanballad iyo Toobiyaah iyo Geshem kii
Carabka ahaa, iyo cadaawayaashayadii kale loo sheegay
inaan derbigii dhisay iyo inaan innaba daldalool lagu arag (in
kastoo wakhtigaas aanan weli qotomin albaabbadii irdaha),
2 ayay Sanballad iyo Geshem ii soo cid direen oo waxay
yidhaahdeen, Kaalay oo aan ku wada kulanno tuulooyinka
bannaanka Oonoo ku yaal middood. Laakiinse waxay ku
fikireen inay belaayo igu sameeyaan. 3 Oo waxaan u diray
wargeeyayaal, oo ku idhi, Waxaan samaynayaa shuqul
weyn oo sidaas daraaddeed ma iman karo. Bal maxaa
shuqulku u joogsanayaa markaan ka tago oo aan idiin
imaado? 4 Oo fartiin caynkaas ah ayay afar jeer ii soo
direen; oo anna isla sidii baan ugu jawaabay. 5 Oo haddana
isla sidaas oo kale Sanballad wuxuu markii shanaad ii soo
diray midiidinkiisii oo gacanta ku sida warqad furan. 6
Oo waxaa ku qornaa, Waxaa quruumaha dhexdooda laga
sheegay, Gashmuuna uu leeyahay, in adiga iyo Yuhuudduba
aad ku talo jirtaan inaad fallaagowdaan, oo waa taas
daraaddeed waxaad derbiga u dhisaysaa, oo sida waafaqsan
erayadan la soo sheegay waxaad doonaysaa inaad boqor
u ahaatid. 7 Oo weliba waxaad dooratay nebiyo si ay
wax kugu saabsan dadka Yeruusaalem ugu wacdiyaan,
iyagoo leh, Dalka Yahuudah waxaa jooga boqor. Haddaba
erayadan waxaa loo sheegi doonaa boqorka. Haddaba
sidaas daraaddeed kaalay, oo aan tashannee. 8 Markaasaan
u cid diray oo ku idhi, Waxaad leedahay oo kale halkan
innaba laguma samayn, laakiinse adigaa qalbigaaga ka soo
hindisay. 9 Waayo, dhammaantood waxay doonayeen inay
na cabsiiyaan, oo waxay isyidhaahdeen, Shuqulkay ka daali
doonaan, mana dhammayn doonaan. Laakiinse, Ilaahow,
xoog ii yeel. 10 Markaasaan tegey gurigii Shemacyaah ina
Delaayaah oo ahaa ina Meheetabeel oo xidhnaa; oo wuxuu
igu yidhi, Guriga Rabbiga oo ah macbudka dhexdiisa aan ku
kulanno, oo aan xidhanno albaabbada macbudka, waayo,
iyagu waxay u iman doonaan inay ku dilaan. Haah, oo
habeennimada ayay u soo iman doonaan inay ku dilaan.
11 Aniguse waxaan ku idhi, Nin anigoo kale ahu miyuu
cararaa? Bal waase kee, kan aniga ila mid ah oo macbudka
u geli lahaa inuu naftiisa ku badbaadiyo? Geli maayo. 12
Markaasaan gartay inaan Ilaah isaga soo dirin, laakiinse
hadal iga gees ah ayuu ugu hadlay sidii nebi oo kale,
waayo, waxaa soo kiraystay Toobiyaah iyo Sanballad. 13 Oo
taas aawadeed baa isaga loo soo kiraystay inaan cabsado
oo saas yeelo oo aan dembaabo, iyo inay iyagu sabab
u helaan war xun si ay iigu ceebeeyaan. 14 Haddaba
Ilaahayow, sida shuqulladoodu yihiin u xusuuso Toobiyaah
iyo Sanballad iyo weliba nebiyaddii Noocadyaah iyo nebiyadii
kale oo damcay inay i cabsigeliyaan. 15 Oo sidaasaa
derbigii laba iyo konton maalmood loogu dhammeeyey
bishii Eluul maalinteedii shan iyo labaatanaad. 16 Oo markii
cadaawayaashayadii oo dhammu ay taas maqleen ayay
kulli quruumihii hareerahayaga ku wareegsanaa oo dhammu
wada cabsadeen, oo aad bay u ceeboobeen, waayo, waxay
garteen in shuqulkan laga sameeyey Ilaahayaga xaggiisa.
17 Oo weliba waagaas kuwii gobta ahaa oo dalka Yahuudah
warqado badan bay u direen Toobiyaah, oo iyagana waxaa
u yimid warqadihii Toobiyaah. 18 Waayo, dalka Yahuudah
waxaa joogay kuwo badan oo isaga u dhaartay, maxaa
yeelay, isaga waxaa soddog u ahaa Shekaanyaah ina Aarax;
oo wiilkiisii Yehooxaanaanna wuxuu guursaday Meshullaam
ina Berekyaah gabadhiisii. 19 Oo weliba waxay hortayda
kaga hadleen falimihiisii wanaagsanaa, oo hadalkaygana
isagay u sheegeen. Toobiyaahna warqaduu iigu soo diray
inuu i cabsiiyo.

7 Haddaba markii derbigii la dhisay, oo aan taagay
albaabbadii, oo irid-dhawryadii iyo kuwii gabayaaga ahaa
iyo kuwii reer Laawi la doortay, 2 ayaan Yeruusaalem madax
uga dhigay walaalkay Xanaanii, iyo Xananyaah oo ahaa
taliyihii qalcadda, waayo, wuxuu ahaa nin aamin ah, oo
cabsida Ilaahna dad badan buu kaga horreeyey. 3 Oo
waxaan iyagii ku idhi, Jeer ay qorraxdu kululaato yaan la
furin irdaha Yeruusaalem, oo intay waardiyayaashu taagan
yihiin albaabbada ha la xidho, oo idinku qataara, dadka
Yeruusaalem degganna waardiyayaal ka doorta, oo mid
waluba ha dhawro meel gurigiisa ka soo hor jeedda. 4
Haddaba magaaladu way ballaadhnayd, wayna weynayd,
laakiinse dadku way ku yaraayeen, oo guryihiina ma ay
dhisnayn. 5 Markaasaa Rabbigu wuxuu qalbigayga geliyey
inaan soo wada ururiyo kuwii gobta ahaa, iyo taliyayaashii, iyo
dadkii oo dhanba in abtiriskooda la tiriyo. Oo waxaan helay
buuggii uu ku qornaa abtiriskii kuwii markii hore yimid, oo

waxaan ka helay oo gudihiisa ku qornaa: 6 Haddaba kuwanu
waa dadkii gobolka ee ka soo noqday maxaabiisnimadii, oo
ku jiray kuwii la kaxaystay, oo Nebukadnesar oo ahaa boqorkii
Baabuloon uu u kaxaystay Baabuloon, oo ku soo noqday
Yeruusaalem iyo dalkii Yahuudah, mid waluba magaaladiisii, 7
oo waxay la yimaadeen Serubaabel, Yeeshuuca, Nexemyaah,
Casaryaah, Racamyaah, Naxamaanii, Mordekay, Bilshaan,
Misfered, Bigway, Nexuum, iyo Bacanaah. Haddaba waa tan
tiradii dadkii reer binu Israa'iil: 8 Reer Farcosh waxaa ka soo
noqday laba kun iyo boqol iyo laba iyo toddobaatan, 9 reer
Shefatyaahna saddex boqol iyo laba iyo toddobaatan, 10 reer
Aaraxna lix boqol iyo laba iyo konton, 11 reer Fahad Moo'aab
oo ahaa reer Yeeshuuca iyo reer Yoo'aabna laba kun iyo
siddeed boqol iyo siddeed iyo toban, 12 reer Ceelaamna
kun iyo laba boqol iyo afar iyo konton, 13 reer Satuuna
siddeed boqol iyo shan iyo afartan, 14 reer Sakayna toddoba
boqol iyo lixdan, 15 reer Binnuwiina lix boqol iyo siddeed iyo
afartan, 16 reer Beebayna lix boqol iyo siddeed iyo labaatan,
17 reer Casgaadna laba kun iyo saddex boqol iyo laba iyo
labaatan, 18 reer Adoniiqaamna lix boqol iyo toddoba iyo
lixdan, 19 reer Bigwayna laba kun iyo toddoba iyo lixdan,
20 reer Caadiinna lix boqol iyo shan iyo konton, 21 reer
Aateer oo ahaa reer Xisqiyaahna siddeed iyo sagaashan, 22
reer Xaashumna saddex boqol iyo siddeed iyo labaatan,
23 reer Beesayna saddex boqol iyo afar iyo labaatan, 24
reer Xaariifna boqol iyo laba iyo toban, 25 reer Gibecoonna
shan iyo sagaashan, 26 raggii reer Beytlaxam iyo reer
Netofaahna boqol iyo siddeed iyo siddeetan, 27 raggii reer
Canaatoodna boqol iyo siddeed iyo labaatan, 28 raggii reer
Beytasmaawedna laba iyo afartan, 29 raggii reer Qiryad
Yecaariim, iyo reer Kefiiraah, iyo reer Bi'iroodna toddoba
boqol iyo saddex iyo afartan, 30 raggii reer Raamaah iyo
reer Gebacna lix boqol iyo kow iyo labaatan, 31 raggii reer
Mikmaasna boqol iyo laba iyo labaatan, 32 raggii reer Beytel
iyo reer Aaciina boqol iyo saddex iyo labaatan, 33 raggii
reer Nebona laba iyo konton, 34 reerkii Ceelaamtii kalena
kun iyo laba boqol iyo afar iyo konton, 35 reer Haarimna
saddex boqol iyo labaatan, 36 reer Yerixoona saddex boqol
iyo shan iyo afartan, 37 reer Lod, iyo reer Xaadiid, iyo
reer Oonoona toddoba boqol iyo kow iyo labaatan, 38 reer
Senaacaahna saddex kun iyo sagaal boqol iyo soddon. 39
Oo wadaaddadiina waxay ahaayeen reer Yedacyaah oo
ahaa reer Yeeshuuca oo ahaa sagaal boqol iyo saddex iyo
toddobaatan, 40 reer Immeerna kun iyo laba iyo konton, 41
reer Fashxuurna kun iyo laba boqol iyo toddoba iyo afartan,
42 reer Haarimna kun iyo toddoba iyo toban. 43 Kuwii reer
Laawina waxay ahaayeen reer Yeeshuuca kii reer Qadmii'eel
oo ahaa reer Xoodawyaah afar iyo toddobaatan. 44 Oo
nimankii gabayaaga ahaa oo reer Aasaaf ahaana waxay
ahaayeen boqol iyo siddeed iyo afartan. 45 Oo kuwii irdaha
dhawri jiray oo ahaa reer Shalluum, iyo reer Aateer, iyo reer
Talmon, iyo reer Caquub, iyo reer Xatiitaa, iyo reer Shobay
waxay isku ahaayeen boqol iyo siddeed iyo soddon. 46
Oo reer Netiiniimna waxay ahaayeen reer Siixaa, iyo reer
Xasufaa, iyo reer Tabbaacood, 47 iyo reer Qeeros, iyo reer
Siicaa, iyo reer Faadoon, 48 iyo reer Lebaanaa, iyo reer
Xagaabaah, iyo reer Shalmay, 49 iyo reer Xaanaan, iyo
reer Giddeel, iyo reer Gaxar, 50 iyo reer Re'aayaah, iyo
reer Resiin, iyo reer Neqoodaa, 51 iyo reer Gasaam, iyo
reer Cuusaa, iyo reer Faasee'ax, 52 iyo reer Beesay, iyo
reer Mecuuniim, iyo reer Nefiishesiim, 53 iyo reer Baquuq,
iyo reer Xaquufaa, iyo reer Xarxuur, 54 iyo reer Basliid,
iyo reer Mexiidaa, iyo reer Xarshaa, 55 iyo reer Barqoos,
iyo reer Siiseraa, iyo reer Temax, 56 iyo reer Nesiyax,
iyo reer Xatiifaa. 57 Oo ilmihii addoommadii Sulaymaanna
waxay ahaayeen reer Sotay, iyo reer Sofered, iyo reer
Feriidaa, 58 iyo reer Yacalaa, iyo reer Darqoon, iyo reer
Giddeel, 59 iyo reer Shefatyaah, iyo reer Xatiil, iyo reer
Fokered Hasebaayiim, iyo reer Aamoon. 60 Oo reer Netiiniim
oo dhan iyo ilmihii addoommadii Sulaymaan waxay isku
ahaayeen saddex boqol iyo laba iyo sagaashan. 61 Oo
kuwanuna waxay ahaayeen kuwii ka tegey Teel Melax, iyo
Teel Xarshaa, iyo Keruub, iyo Addoon, iyo Immeer, laakiinse
iyagu ma ay sheegi karin qabiilkoodii ama jilibkoodii, iyo
inay reer binu Israa'iil ahaayeen iyo in kale toona, 62 oo
reer Delaayaah, iyo reer Toobiyaah, iyo reer Neqoodaa
waxay isku ahaayeen lix boqol iyo laba iyo afartan. 63 Oo
kuwii wadaaddada ahaa waxay ahaayeen reer Xaabaayaah,
iyo reer Xaqoos, iyo reer Barsillay oo naag ka guursaday
gabdhaha Gilecaad oo iyaga lagu magacaabay. 64 Kuwanu
waxay magacyadoodii ka doondooneen buuggii abtiriska,
laakiinse lagama helin, sidaas aawadeed wadaadnimadii
waa laga saaray sidii iyagoo nijaas ah. 65 Oo taliyihii baa
iyagii ku amray inayan waxyaalaha ugu quduusan wax
ka cunin jeer wadaad Uuriim iyo Tummiim leh kaco. 66
Oo ururka oo dhammu wuxuu giddigiis isku ahaa laba iyo
afartan kun iyo saddex boqol iyo lixdan, 67 oo intaas waxaa
gooni ka ahaa raggii addoommadooda ahaa iyo naagihii
addoommahooda ahaa, oo iyana waxay ahaayeen toddoba
kun iyo saddex boqol iyo toddoba iyo soddon, oo waxay
lahaayeen laba boqol iyo shan iyo afartan oo ah rag iyo
naago gabya. 68 Fardahoodu waxay ahaayeen toddoba
boqol iyo lix iyo soddon, baqlahooduna laba boqol iyo shan
iyo afartan, 69 geelooduna afar boqol iyo shan iyo soddon,

dameerahooduna lix kun iyo toddoba boqol iyo labaatan. 70
Oo madaxdii qabiilooyinka qaarkood ayaa shuqulkii wax u
bixiyey. Taliyuhu wuxuu khasnadda siiyey kun dirham oo
dahab ah, iyo konton maddiibadood, iyo shan boqol iyo
soddon khamiis oo ah dhar wadaadood. 71 Oo madaxdii
qabiilooyinka qaarkood ayaa khasnaddii shuqulka geliyey
labaatan kun oo dirham oo dahab ah, iyo laba kun iyo laba
boqol oo mina oo lacag ah. 72 Oo dadka intiisii kale wixii
ay bixiyeen waxay ahaayeen labaatan kun oo dirham oo
dahab ah, iyo laba kun oo mina oo lacag ah, iyo toddoba
iyo lixdan khamiis oo ah dhar wadaadood. 73 Haddaba
wadaaddadii, iyo kuwii reer Laawi, iyo irid-dhawryadii, iyo
nimankii gabayaaga ahaa, iyo dadkii qaarkiis, iyo reer
Netiiniim, iyo reer binu Israa'iil oo dhammu waxay degeen
magaalooyinkoodii. Oo markii bishii toddobaad la gaadhay
reer binu Israa'iil waxay joogeen magaalooyinkoodii.

**8** Oo dadkii oo dhammu iyagoo ah sidii nin keliya ayay
dhammaantood ku soo wada urureen meesha bannaan
oo iridda biyaha ka horraysa; oo karraanigii Cesraa ahaa
ayay kula hadleen oo u sheegeen inuu keeno kitaabkii
sharciga Muuse oo Rabbigu ku amray reer binu Israa'iil. 2
Markaasaa wadaadkii Cesraa sharcigii hor keenay ururkii
ahaa rag iyo dumar iyo in alla intii waxgarasho ku maqli kartay
oo dhan, oo waxayna ahayd bishii toddobaad maalinteedii
kowaad. 3 Oo isna wixii kitaabkii ku qornaa ayuu ku akhriyey
meeshii bannaanayd oo iridda biyaha ka horraysay, oo wuxuu
akhriyeyey aroortii ilaa hadhkii, wuxuuna ku hor akhriyey
raggii iyo dumarkii iyo kuwii garan karayay; oo dadkii oo
dhammuna aad bay u dhegaysanayeen kitaabkii sharciga. 4
Oo karraanigii Cesraa ahaa wuxuu kor taagnaa meel sare
oo alwaax laga sameeyey oo sababtaas aawadeed loo
dhisay; oo dhankiisa midigta waxaa taagnaa Matityaah,
iyo Shemac, iyo Canaayaah, iyo Uuriyaah, iyo Xilqiyaah,
iyo Macaseeyaah; oo dhankiisa bidixdana waxaa taagnaa
Fedaayaah, iyo Miishaa'eel, iyo Malkiyaah, iyo Xaashum,
iyo Xashbaddaanaah, iyo Sekaryaah, iyo Meshullaam. 5
Markaasaa Cesraa kitaabkii furay iyadoo dadkii oo dhammu
wada arkaan, (waayo, wuu ka wada korreeyey dadka oo
dhan; ) oo markuu furay ayaa dadkii oo dhammu wada
istaagay. 6 Kolkaasaa Cesraa ammaanay Rabbiga ah
Ilaaha weyn, oo dadkii oo dhammuna intay gacmaha kor
u qaadeen ayay ku jawaabeen, Aamiin, Aamiin; oo intay
madaxa foororiyeen ayay Rabbiga u sujuudeen oo wejiga
dhulka saareen. 7 Oo weliba waxaa kaloo dadkii sharciga
garansiiyey Yeeshuuca, iyo Baanii, iyo Sheereebyaah, iyo
Yaamiin, iyo Caquub, iyo Shabbetay, iyo Hoodiyaah, iyo
Macaseeyaah, iyo Qeliitaa, iyo Casaryaah, iyo Yoosaabaad,
iyo Xaanaan, iyo Felaayaah, iyo kuwii reer Laawi, oo dadkiina
meeshoodii ayay istaageen. 8 Oo kitaabkii sharciga Ilaah si
bayaan ah ayaa loo akhriyey, waana la micneeyey si dadku u
garto waxa la akhriyey. 9 Markaasaa Nexemyaah oo taliyaha
ahaa, iyo wadaadkii Cesraa oo karraaniga ahaa, iyo kuwii
reer Laawi oo dadka wax bari jiray, waxay dadkii oo dhan
ku wada yidhaahdeen, Maanta waxay Rabbiga Ilaahiinna
ah u tahay maalin quduus ah, haddaba ha barooranina,
hana ooyina, maxaa yeelay, dadkii oo dhammu way wada
ooyeen markay maqleen erayadii sharciga. 10 Oo haddana
wuxuu iyagii ku yidhi, Taga, oo baruurta cuna, oo wax
macaan cabba, oo kii aan wax u diyaarsanaynna qayb u
dira, waayo, maanta waxay Rabbigeenna u tahay maalin
quduus ah, hana murugoonina, waayo, idinka waxaa xoog
idiin ah farxadda Rabbiga. 11 Haddaba kuwii reer Laawi ayaa
dadkii oo dhan aamusiiyey, oo waxay ku yidhaahdeen, War
maanta waa quduuse iska aamusa oo ha murugoonina. 12
Markaasay dadkii oo dhammu iska tageen inay wax cunaan,
oo wax cabbaan, oo ay qaybo diraan, oo ay aad u farxaan,
maxaa yeelay, waxay garteen erayadii loo caddeeyey. 13 Oo
madaxdii qabiilooyinka dadka oo dhan, iyo wadaaddadii,
iyo kuwii reer Laawi ayaa maalintii labaad karraanigii
Cesraa ugu soo wada urureen inay erayada sharciga aad u
dhegaystaan. 14 Oo waxaa sharcigii ku qornaa oo ay ka
dhex heleen in Rabbigu Muuse ku amray in reer binu Israa'iil
ay waabab ku hoydaan inta lagu jiro iidda bisha toddobaad,
15 iyo inay iyaga waajib ku tahay inay kaga dhawaaqaan
oo ka naadiyaan magaalooyinkooda oo dhan iyo xataa
Yeruusaalem gudaheeda, oo ay yidhaahdaan, Buurta taga
oo ka soo gura laamo saytuun ah, iyo kuwo saytuun
dibadeed ah, iyo laamo ah geedo hadaas la yidhaahdo,
iyo laamo cawbaar ah, iyo geedo waaweyn laamahood in
laga sameeyo waabab sida qoran. 16 Sidaas daraaddeed
dadkii way bexeen, oo laamihii keeneen, oo waxay dhisteen
waabab, oo mid waluba wuxuu ka dhistay saqafka gurigiisa,
iyo barxadahooda, iyo barxadihii guriga Ilaah, iyo meeshii
bannaanayd oo Iridda Biyaha, iyo meeshii bannaanayd oo
Iridda Efrayim. 17 Oo kulli intii maxaabiisnimada ka soo
noqotay ururkoodii oo dhammu waxay dhisteen waabab oo
waxay degeen waababkii; waayo, reer binu Israa'iil saas
ma ay yeelin tan iyo wakhtigii Yashuuca ina Nuun iyo ilaa
maalintaas. Oo ayaantaas waxaa jirtay farxad aad u weyn.
18 Oo maalintii ugu horraysay ilaa maalintii ugu dambaysay
ayuu maalin kasta kitaabkii sharciga Ilaah akhriyi jiray. Oo
toddoba maalmood way iidayeen, oo maalintii siddeedaadna

waxaa jiray shir iidda lagu dhammaynayay sida qaynuunka
waafaqsanayd.

9 Haddaba bisha afar iyo labaatankeedii ayaa reer binu
Israa'iil soo shireen iyagoo sooman oo dhar joonyad ah
guntan oo ciid isku shubay. 2 Markaasaa farcankii reer binu
Israa'iil waxay iska sooceen dad qalaad oo dhan, oo intay
istaageen ayay qirteen dembiyadoodii iyo xumaatooyinkii
awowayaashood. 3 Kolkaasay meeshoodii istaageen oo
akhriyeen kitaabkii sharciga Rabbiga Ilaahooda ah intii maalin
rubuceed ah; oo haddana rubuc kale ayay wax qirteen,
wayna u sujuudeen Rabbiga Ilaahooda ah. 4 Markaasaa
darajadii reer Laawi waxaa ku kor istaagay Yeeshuuca,
iyo Baanii, iyo Qadmii'eel, iyo Shebanyaah, iyo Bunnii, iyo
Sheereebyaah, iyo Baanii, iyo Kenaanii, oo cod weyn ayay
ugu qayshadeen Rabbiga Ilaahooda ah. 5 Markaasaa kuwii
reer Laawi oo ahaa Yeeshuuca, iyo Qadmii'eel, iyo Baanii,
iyo Xashabneyaah, iyo Sheereebyaah, iyo Hoodiyaah, iyo
Shebanyaah, iyo Fetaxyaah, waxay dadkii ku yidhaahdeen,
War istaaga oo Rabbiga Ilaahiinna ah ammaana weligiis
iyo weligiis, oo waxay yidhaahdeen, Magacaaga ammaanta
badan ha la ammaano, kaasoo ka wada sarreeya kulli mahad
iyo ammaan oo dhan. 6 Adigaa Rabbiga ah oo keligaa
baa ah. Waxaad samaysay samada, taasoo ah samada
samooyinka, iyo ciidankooda oo dhan, iyo dhulka iyo waxa
kor jooga oo dhan, iyo badaha iyo waxa ku jira oo dhan,
dhammaantood adigaa sii nooleeya, oo ciidanka samaduna
adigay kuu sujuudaan. 7 Adigaa ah Rabbiga Ilaaha ah
oo Aabraam doortay, oo isaga ka soo bixiyey Uur tii reer
Kaldayiin, oo u bixiyey magaca Ibraahim la yidhaahdo, 8
oo dabadeedna ogaaday in qalbigiisu hortaada aamin ku
yahay, oo isagii axdi kula dhigtay inaad isaga siinaysid dalka
reer Kancaan, iyo reer Xeed, iyo reer Amor, iyo reer Feris,
iyo reer Yebuus, iyo reer Girgaash, xataa inaad dalkaas
siinaysid farcankiisa; oo erayadaadiina waad oofisay, maxaa
yeelay, xaq baad tahay. 9 Adigu waxaad aragtay dhibkii
awowayaashayo dalka Masar ku qabeen, waanad maqashay
qayladoodii ay Badda Cas agteeda ka qaysheen; 10 oo
weliba Fircoon iyo addoommadiisii oo dhan, iyo kulli dadkii
dalkiisa oo dhan waxaad tustay calaamooyin iyo yaabab,
waayo, waad ogayd inay iyaga ku kibreen, oo halkaas
magac baad ku heeshay siday maanta tahay. 11 Oo iyagii
hortood ayaad baddii kala qaybisay, oo waxay mareen badda
dhexdeedii, oo dhul engegan bay ku socdeen, oo kuwii iyaga
eryanayayna sidii dhagax biyo xoog badan lagu dhex riday
ayaad moolka ugu tuurtay. 12 Oo weliba maalintii waxaad ku
hoggaamisay tiir daruur ah, habeenkiina tiir dab ah, si aad
ugu iftiimiso jidkii ay marayeen. 13 Waxaad weliba ku soo
kor degtay Buur Siinay, oo iyagaad kala hadashay xagga
samada, oo waxaad siisay xukummo qumman, iyo sharciyaal
xaq ah, iyo qaynuunno wanwanaagsan, iyo amarro, 14 oo
waxaad ogeysiisay Sabtidaada quduuska ah, oo ku amartay
amarro, iyo qaynuunno, iyo sharci aad ugu soo dhiibtay
addoonkaagii Muuse. 15 Oo kibis ay ku gaajo baxaan baad
samada ka siisay, biyo ay ku oon baxaanna dhagax baad uga
soo daysay, oo waxaad ku amartay inay galaan oo hantiyaan
dalkii aad ku dhaaratay inaad siinaysid. 16 Laakiinse iyagii
iyo awowayaashayaba way kibreen, oo luquntay adkeeyeen,
oo amarradaadiina ma ay maqlin, 17 wayna diideen inay
addeecaan, kamana ay fiirsan yaababkaagii aad dhexdooda
ku samaysay, laakiinse luquntay adkeeyeen, oo iyagoo
caasi ah ayay sirkaal doorteen inay addoonnimadoodii
ku noqdaan; laakiinse adigu waxaad tahay Ilaah diyaar
u ah inuu wax cafiyo, waxaanad tahay nimco miidhan,
oo waxaa kaa buuxda raxmad, cadho waad u gaabisaa,
naxariisna hodan baad ka tahay, oo iyagiina ma aadan
dayrin. 18 Oo xataa markay samaysteen weyl dahab la
shubay ah, oo ay isku yidhaahdeen, Kanu waa Ilaahaagii
kaa soo bixiyey dalkii Masar; oo ay aad kaaga dhirfiyeen,
19 de weliba naxariistaada badan aawadeed iyagii kuma
aadan dayrin cidladii. Maalinnimadii tiirkii daruurta ahaa
kama uu tegin iyagii si uu jidka ugu hoggaamiyo, oo tiirkii
dabka ahaana habeennimadii kama uu tegin si uu iftiin ugu
noqdo oo uu jidkii ay mari lahaayeen ugu muujiyo. 20 Oo
weliba waxaad siisay ruuxaagii wanaagsanaa inuu iyagii
wax baro, oo afkoodana kama aadan joojin maannadaadii,
biyo ay ka oon baxaanna waad siisay. 21 Haah, afartan
sannadood ayaad iyaga cidlada ku xannaanaynaysay,
oo waxba uma ayan baahan, dharkoodiina kama uusan
duugoobin, cagahoodiina ma ayan bararin. 22 Oo weliba
waxaad iyaga siisay oo saami ugu qaybisay boqortooyooyin
iyo dadyow kale, oo sidaasay u hantiyeen dalkii Siixon oo
ahaa boqorkii Xeshboon, iyo dalkii Coog oo ahaa boqorkii
Baashaan. 23 Oo carruurtoodiina waxaad u badisay sida
xiddigaha samada oo kale, oo iyagii waxaad keentay dalkii
aad awowayaashood ku tidhi, Iyagu waa inay galaan si
ay u hantiyaan. 24 Markaasay carruurtii dalkii galeen oo
hantiyeen, oo waxaad ka hoosaysiisay dadkii dalka degganaa
oo ahaa reer Kancaan, waanad gelisay gacmahoodii, iyagii
iyo boqorradoodii iyo dadyowgii dalka degganaaba, inay
iyaga ku sameeyaan wax alla waxay doonayaan. 25 Oo
waxay qabsadeen magaalooyin deyr leh iyo dal barwaaqo
leh, oo waxay hantiyeen guryo ay ka buuxaan wax kasta
oo wanaagsanu, iyo berkedo qodan, iyo beero canab ah,

iyo beero saytuun ah, iyo geedo midho leh oo faro badan.
Haddaba wax bay cuneen oo dhergeen, wayna cayileen, oo
waxay ku farxeen wanaaggaaga weyn. **26** Habase yeeshee
way dhega adkaadeen oo kaa caasiyoobeen; sharcigaagiina
gadaashooday ku tuureen, oo waxay dileen nebiyadaadii
iyaga ku markhaati furay oo doonayay inay mar kale kuu soo
celiyaan, oo aad bay kaaga dhirfiyeen. **27** Sidaas daraaddeed
waxaad gacanta u gelisay cadaawayaashoodii, oo iyana way
dhibeen; oo markii ay dhibtoodeen oo ay kuu qayshadeen,
samadaad ka maqashay; oo naxariistaada badan aawadeed
waxaad siisay badbaadshayaal cadaawayaashooda ka
badbaadshay. **28** Laakiin markay nasteen ayay wax shar ah
hortaada ku sameeyeen, oo sidaas daraaddeed waxaad
u daysay gacantii cadaawayaashooda, oo iyana way
addoonsadeen iyagii; illowse markay kuu soo noqdeen oo ay
kuu qayshadeen, samadaad ka maqashay; oo marar badan
ayaad naxariistaada aawadeed ku samatabbixisay; **29** oo
aad ku markhaati furtay, si aad mar kale sharcigaaga ugu
soo celiso; laakiinse way kugu kibreen oo amarradaadiina
ma ay maqlin, illowse xukummadaadii way ku dembaabeen,
(kaasoo haddii nin sameeyo uu ku dhex noolaan lahaa,
) oo intay kaa jeesteen ayay luqunta adkeeyeen, wayna
diideen inay maqlaan. **30** Oo weliba sannado badan baad
u dulqaadatay, oo Ruuxaaga ayaad ugu markhaati furtay
adigoo nebiyadaadii ka dhex hadlaya; laakiinse dheg
uma ayan dhigin, oo sidaas daraaddeed waxaad gelisay
gacantii dadyowgii dalka degganaa. **31** Habase yeeshee
naxariistaada badan aawadeed dhammaantood ma aadan
wada baabbi'in, mana aadan dayrin, maxaa yeelay, waxaad
tahay Ilaah raxmad iyo naxariis badan. **32** Haddaba sidaas
daraaddeed Ilaahayaga weyn, oo Qaadirka ah, oo laga
cabsado, oo xajiya axdiga iyo naxariistow, dhibkan oo
dhammu yuusan wax yar kula ekaan, kaasoo ku soo kor
degay annaga, iyo boqorradayadii, iyo amiirradayadii, iyo
wadaaddadayadii, iyo nebiyadayadii, iyo awowayaashayadii,
iyo dadkaagii oo dhan, tan iyo wakhtigii boqorradii Ashuur
iyo ilaa maantadan la joogo. **33** Si kastaba ha ahaatee xaq
baad ku tahay waxa nagu dhacay oo dhan, maxaa yeelay,
run baad ku socotay, annaguse shar baannu samaynay, **34**
oo boqorradayadii, iyo amiirradayadii, iyo wadaaddadayadii,
iyo awowayaashayadii toona ma ay dhawrin sharcigaagii,
mana ay dhegaysan amarradaadii iyo markhaatifurkaagii
aad ugu marag furtay. **35** Waayo, boqortooyadoodii kuuguma
ay adeegin wanaaggaagii weynaa oo aad siisay aawadiis,
iyo dalka ballaadhan oo barwaaqaysan oo aad hortooda
dhigtay aawadiis, oo kamana ay soo noqon shuqulladoodii
sharka ahaa. **36** Bal eeg, annagu maanta waxaannu
nahay addoommo, oo dalkii aad awowayaashayo u siisay
inay midhihiisa iyo wanaaggiisa cunaan, bal eeg, annagu
dhexdiisaannu addoommo ku nahaye. **37** Oo bal eeg,
wuxuu midho badan u dhalaa boqorradii aad korkayaga
ka yeeshay dembigayaga aawadiis; oo weliba waxay ugu
taliyaan jidhkayaga iyo xoolahayagaba siday doonayaan,
oo annana cidhiidhi weyn baannu ku jirnaa. **38** Oo weliba
waxaas oo dhan aawadood waxaannu kula dhiganaynaa
axdi daacad ah, waannuna qoraynaa, oo waxaa shaabad ku
dhammaynaya amiirradayada, iyo kuwayaga reer Laawi, iyo
wadaaddadayada.

**10** Haddaba kuwii shaabad ku dhammeeyey waxay
ahaayeen Nexemyaah oo ahaa taliyaha oo ahaa ina
Xakalyaah, iyo Sidqiyaah, **2** iyo Seraayaah, iyo Casaryaah,
iyo Yeremyaah, **3** iyo Fashxuur, iyo Amaryaah, iyo Malkiiyaah,
**4** iyo Xatuush, iyo Shebanyaah, iyo Malluug, **5** iyo Haarim,
iyo Mereemood, iyo Cobadyaah, **6** iyo Daanyeel, iyo
Ginnetoon, iyo Baaruug, **7** iyo Meshullaam, iyo Abiiyaah, iyo
Miyaamin, **8** iyo Macasyaah, iyo Bilgay, iyo Shemacyaah.
Oo intaasu waxay ahaayeen wadaaddadii. **9** Oo kuwii reer
Laawina waxay ahaayeen Yeeshuuca ina Asanyaah, iyo
Binnuwii oo ahaa reer Xeenaadaad, iyo Qadmii'eel, **10**
iyo walaalahood oo ahaa Shebanyaah, iyo Hoodiyaah, iyo
Qeliitaa, iyo Felaayaah, iyo Xaanaan, **11** iyo Miikaa, iyo
Rexob, iyo Xashabyaah, **12** iyo Sakuur, iyo Sheereebyaah,
iyo Shebanyaah, **13** iyo Hoodiyaah, iyo Baanii, iyo Beniinuu.
**14** Oo madaxdii dadkuna waxay ahaayeen: Farcosh, iyo
Faxad Moo'aab, iyo Ceelaam, iyo Satuu, iyo Baanii, **15**
iyo Bunnii, iyo Casgaad, iyo Beebay, **16** iyo Adoniiyaah,
iyo Bigway, iyo Caadiin, **17** iyo Aateer, iyo Xisqiyaah, iyo
Casuur, **18** iyo Hoodiyaah, iyo Xaashum, iyo Beesay, **19**
iyo Xaariif, iyo Canaatood, iyo Noobay, **20** iyo Magfiicaash,
iyo Meshullaam, iyo Xeesiir, **21** iyo Mesheysabeel, iyo
Saadooq, iyo Yadduuca, **22** iyo Felatyaah, iyo Xaanaan,
iyo Canaayaah, **23** iyo Hoosheeca, iyo Xananyaah, iyo
Xashuub, **24** iyo Hallooxeesh, iyo Filxaa, iyo Shoobeeq, **25**
iyo Rexuum, iyo Xashabnaah, iyo Macaseeyaah, **26** iyo
Axiiyaah, iyo Xaanaan, iyo Caanaan, **27** iyo Malluug, iyo
Haarim, iyo Bacanaah. **28** Oo dadka intiisii kale oo dhan oo
ahaa wadaaddadii, iyo kuwii reer Laawi, iyo irid-dhawryadii,
iyo kuwii gabayaaga ahaa, iyo reer Netiiniim, iyo kulli intii
iska soocday dadyowgii dalka degganaa oo raacday sharcigii
Ilaah, iyo naagahoodii, iyo wiilashoodii, iyo gabdhahoodii,
iyo mid kasta oo lahaa aqoon iyo waxgarasho, **29** waxay
raaceen walaalahoodii gobtoodii ahaa, oo waxay galeen
dhaar habaar leh inay ku soconayaan sharciga Ilaah oo

loo soo dhiibay Muuse oo ahaa addoonkii Ilaah, iyo inay
dhawrayaan oo wada yeelayaan amarrada Rabbiga ah
Sayidkeenna, iyo xukummadiisa iyo qaynuunnadiisa, 30 iyo
inaynaan gabdhaheenna siinayn dadyowga dalka deggan,
oo aynaan gabdhahoodana wiilasheenna u guurinayn; 31 iyo
haddii dadyowga dalka degganu ay maalinta sabtida keenaan
waxyaalo iib ah iyo cunto uun inaynaan iibsanayn maalintii
sabtida iyo maalin quduus ah toona, iyo inaan sannadda
toddobaad beeraha dayno oo qaan kasta saamaxno. 32
Oo weliba waxaynu samaysannay amarro inagu xukumaya
inaynu sannad kasta sheqel saddexdaloolkiis u bixinayno
adeegidda guriga Ilaaheenna, taas oo ah: 33 kibistii tusniinta,
iyo qurbaanka hadhuudhka oo joogtada ah, iyo qurbaanka
la gubo oo joogtada ah, iyo kan Sabtiyada, iyo kan bilaha
cusub, iyo kan iidaha la amray, iyo kan waxyaalaha quduuska
ah, iyo qurbaannada dembiga si kafaaraggud loogu sameeyo
reer binu Israa'iil, iyo kulli waxa loo sameeyo guriga Ilaah
oo dhan. 34 Oo innagoo ah wadaaddada iyo kuwii reer
Laawi iyo dadkii kaleba saami baynu u ridannay qurbaanka
qoryaha inaynu wakhtigii sannad kasta la amray qoryo
gelinayno guriga Ilaaheenna sida qolooyinkeennu yihiin,
si qoryaha loogu dul shido meesha allabariga ee Rabbiga
Ilaaheenna ah, siday taasu sharciga ugu qoran tahay, 35 iyo
inaynu sannad kasta guriga Rabbiga keenayno midhaha
ugu horreeya dhulkeenna iyo midhaha ugu horreeya geedo
cayn kasta ah, 36 iyo weliba curadka wiilasheenna iyo
curadka xoolaheenna, siday taasu sharciga ugu qoran
tahay, in curadka lo'deenna iyo idaheenna la keeno guriga
Ilaaheenna oo loo dhiibo wadaaddada ka dhex adeega
guriga Ilaaheenna; 37 iyo inaynu wadaaddada qolalka guriga
Ilaaheenna ugu keenayno inta ugu horraysa cajiinkeenna,
iyo qurbaannadeenna, iyo midhaha geedo cayn kasta ah,
iyo khamriga, iyo saliidda, iyo inaynu waxa dhulkeenna ka
baxa toban meelood meel ka siinayno kuwa reer Laawi,
waayo, reer Laawi waxay meeltobnaadyada ka qaadan jireen
beeraha magaalooyinkeenna oo dhan. 38 Oo wadaadka oo
ah reer Haaruun wuxuu la joogi doonaa kuwa reer Laawi
markay meeltobnaadyada qaadayaan; oo reer Laawina
meeltobnaadyada ay toban meelood meel ka sii bixiyaan
waxay keeni doonaan guriga Ilaaheenna ilaa qolalka ah
guriga khasnadda. 39 Waayo, reer binu Israa'iil iyo reer
Laawi waxay qurbaanka hadhuudhka, iyo kan khamriga, iyo
kan saliidda keeni doonaan qolalka ah meesha ay yaalliin
weelasha meesha quduuska ah, oo ay joogaan wadaaddada
adeega, iyo irid-dhawryada, iyo kuwa gabayaaga ah. Oo
innaguna guriga Ilaaheenna dayrin mayno.

**11** Oo dadka amiirradiisii waxay degeen Yeruusaalem, oo
dadka intiisii kalena waxay saami u riteen inay tobankii
qofba mid ka soo bixiyaan inuu dego magaalada quduuska
ah oo Yeruusaalem, oo sagaalka qof oo kalena ay degaan
magaalooyinka kale. 2 Oo dadkiina waxay u duceeyeen dadkii
ikhtiyaarkooda isu bixiyey inay Yeruusaalem degganaadaan.
3 Haddaba kuwanu waa madaxdii gobolka oo Yeruusaalem
degay, laakiinse magaalooyinkii dalka Yahuudah mid
waluba wuxuu degay meeshii hantidiisii ahayd oo ku tiil
magaalooyinkoodii, oo waxay ahaayeen reer binu Israa'iil,
iyo wadaaddadii, iyo kuwii reer Laawi, iyo reer Netiiniim, iyo
carruurtii addoommadii Sulaymaan. 4 Oo Yeruusaalemna
waxaa degay kuwo reer Yahuudah ah, iyo kuwo reer
Benyaamiin ah. Kuwii reer Yahuudah waxay ahaayeen:
Cataayaah, oo ahaa ina Cusiyaah ina Sekaryaah, ina
Amaryaah, ina Shefatyaah, ina Mahalaleel, oo ahaa reer
Feres, 5 iyo Macaseeyaah oo ahaa ina Baaruug, ina
Kaalxoseh, ina Xasaayaah, ina Cadaayaah, ina Yooyaariib,
ina Sekaryaah oo ahaa kii uu dhalay kii reer Shiilonii. 6
Raggii reer Feres oo Yeruusaalem degganaa oo dhammu
waxay ahaayeen afar boqol iyo siddeed iyo lixdan nin oo
xoog leh. 7 Oo intanuna waa kuwii reer Benyaamiin: Sallu
oo ahaa ina Meshullaam, ina Yooceed, ina Fedaayaah, ina
Qoolaayaah, ina Macaseeyaah, ina Iitii'eel, ina Yeshacyaah.
8 Oo isaga dabadiisna waxaa jiray Gabbay, iyo Sallay, oo
waxay ahaayeen sagaal boqol iyo siddeed iyo labaatan.
9 Oo waxaa madax u ahaa Yoo'eel oo ahaa ina Sikrii; oo
Yahuudah oo ahaa ina Hasenu'aahna wuxuu ahaa kan
labaad oo magaalada u taliya. 10 Oo wadaaddadiina waxay
ahaayeen Yedacyaah oo ahaa ina Yooyaariib iyo Yaakiin,
11 iyo Seraayaah oo ahaa ina Xilqiyaah, ina Meshullaam,
ina Saadooq, ina Meraayood, ina Axiituub oo u talin jiray
guriga Ilaah, 12 iyo walaalahoodii ka shaqayn jiray guriga,
oo waxay ahaayeen siddeed boqol iyo laba iyo labaatan,
iyo Cadaayaah oo ahaa ina Yeroxaam, ina Felaliyaah, ina
Amsii, ina Sekaryaah, ina Fashxuur, ina Malkiiyaah, 13
iyo walaalihiis oo ahaa madaxdii qabiilooyinka, oo waxay
ahaayeen laba boqol iyo laba iyo afartan, iyo Camashay
oo ahaa ina Casareel, ina Axsay, ina Meshilleemood, ina
Immeer; 14 iyo walaalahood oo ahaa rag xoog leh, oo waxay
ahaayeen boqol iyo siddeed iyo labaatan; oo madaxooduna
wuxuu ahaa Sabdii'eel oo ahaa ina Haggedooliim. 15 Kuwii
reer Laawina waxay ahaayeen Shemacyaah oo ahaa ina
Xashuub, ina Casriiqaam, ina Xashabyaah, ina Bunnii; 16
iyo Shabbetay iyo Yoosaabaad oo ka mid ahaa madaxdii
reer Laawi, oo hawsha dibadda oo guriga Ilaah dusha ka
ilaalin jiray, 17 iyo Matanyaah oo ahaa ina Miikaa, ina Sabdii,

ina Aasaaf, oo ahaa madaxda mahadnaqidda tukashada, iyo
Baqbuqyaah oo ahaa kan labaad walaalihiis dhexdooda,
iyo Cabdaa oo ahaa ina Shammuuca, ina Gaalaal, ina
Yeduutuun. 18 Kuwii reer Laawi oo dhan oo magaalada
quduuska ah joogay waxay ahaayeen laba boqol iyo afar iyo
siddeetan. 19 Oo weliba irid-dhawryadii oo ahaa Caquub,
iyo Talmon, iyo walaalahood oo irdaha dhawri jiray waxay
ahaayeen boqol iyo laba iyo toddobaatan. 20 Oo intii ka
hadhay reer binu Israa'iil oo ahaa wadaaddadii iyo kuwii reer
Laawi waxay joogeen magaalooyinka dalka Yahuudah oo
dhan, oo mid waluba wuxuu degganaa dhulkii uu dhaxalka u
helay. 21 Laakiinse kuwii reer Netiiniim waxay degeen Cofel,
oo waxaa reer Netiiniim madax u ahaa Siixaa iyo Gishfaa.
22 Oo kuwii reer Laawi oo Yeruusaalem joogayna waxaa
madax u ahaa Cusii oo ahaa ina Baanii, ina Xashabyaah, ina
Matanyaah, ina Miikaa, oo ka mid ahaa reer Aasaaf oo ahaa
kuwii gabayaaga ahaa, oo u talin jiray hawsha guriga Ilaah.
23 Waayo, waxaa jiray amar iyaga ku saabsan oo boqorka ka
yimid, oo kuwii gabayaaga ahaa waxaa loo xukumay sooryo
rukun ah siday maalin walba ugu baahnaayeen. 24 Oo
Fetaxyaah oo ahaa ina Mesheysabeel oo ahaa reer Serax,
ina Yahuudah, boqorkuu wakiil uga ahaa wax alla wixii dadka
xaalkiisa ku saabsan. 25 Xagga tuulooyinkii iyo beerahooda
qaar reer Yahuudah ah waxay degganaayeen Qiryad Arbac
iyo magaalooyinkeedii, iyo Diibon iyo magaalooyinkeedii,
iyo Yeqabseel iyo tuulooyinkeedii, 26 iyo Yeeshuuca, iyo
Molaadaah, iyo Beytfeled, 27 iyo Xasar Shuucaal, iyo
Bi'ir Shebac iyo magaalooyinkeedii, 28 iyo Siiqlag, iyo
Mekonaah iyo magaalooyinkeedii, 29 iyo Ceyn Rimmoon, iyo
Sorcaah, iyo Yarmuud, 30 iyo Saanoo'ax, iyo Cadullaam, iyo
tuulooyinkoodii, iyo Laakiish iyo beeraheedii, iyo Caseeqaah
iyo magaalooyinkeedii. Sidaasay u degeen Bi'ir Shebac ilaa
dooxadii Xinnom. 31 Oo reer Benyaamiinna waxay degeen
inta laga bilaabo Gebac, iyo Mikmaash, iyo Cayaa, iyo
Beytel iyo magaalooyinkeeda, 32 iyo Canaatood, iyo Nob,
iyo Cananyaah, 33 iyo Xaasoor, iyo Raamaah, iyo Gitayim,
34 iyo Xaadiid, iyo Seboyim, iyo Neballaad, 35 iyo Lod, iyo
Oonoo oo ahayd dooxadii kuwa sancada badan. 36 Oo kuwii
reer Laawi oo reer Yahuudah ku dhex jiray qaybahoodii
qaarkood ayaa ku darsamay reer Benyaamiin.

**12** Haddaba kuwanu waa wadaaddadii iyo kuwii reer Laawi
oo soo raacay Serubaabel oo ahaa ina Salaatii'eel, iyo
Yeeshuuca: Seraayaah, iyo Yeremyaah, iyo Cesraa, 2 iyo
Amaryaah, iyo Malluug, iyo Xatuush, 3 iyo Shekaanyaah,
iyo Rexuum, iyo Mereemood, 4 iyo Iddo, iyo Ginnetoy, iyo
Abiiyaah, 5 iyo Miyaamin, iyo Macadyaah, iyo Bilgaah,
6 iyo Shemacyaah, iyo Yooyaariib, iyo Yedacyaah, 7 iyo
Sallu, iyo Caamooq, iyo Xilqiyaah, iyo Yedacyaah. Intaasu
waxay ahaayeen madaxdii wadaaddada iyo walaalahoodii
joogay wakhtigii Yeeshuuca. 8 Oo weliba kuwii reer Laawi
waxay ahaayeen Yeeshuuca, iyo Binnuwii, iyo Qadmii'eel,
iyo Sheereebyaah, iyo Yahuudah, iyo Matanyaah oo madax
u ahaa mahadnaqidda, isaga iyo walaalihiisba. 9 Oo weliba
Baqbuqyaah iyo Cunnii oo ahaa walaalahood waxay ku jireen
gudaha oo iyagay ka soo hor jeedeen. 10 Oo Yeeshuuca
wuxuu dhalay Yooyaaqiim, Yooyaaqiimna wuxuu dhalay
Eliyaashiib, Eliyaashiibna wuxuu dhalay Yooyaadaac, 11
Yooyaadaacna wuxuu dhalay Yoonaataan, Yoonaataanna
wuxuu dhalay Yadduuca. 12 Oo wakhtigii Yooyaaqiim
waxaa jiray wadaaddo qabiilooyin madax u ahaa; waxaa
reer Seraayaah u ahaa Meraayaah, reer Yeremyaahna
Xananyaah, 13 reer Cesraana Meshullaam, reer Amaryaahna
Yehooxaanaan, 14 reer Meliikuuna Yoonaataan, reer
Shebanyaahna Yuusuf, 15 reer Haarimna Cadnaa, reer
Meraayoodna Xelqay, 16 reer Iddona Sekaryaah, reer
Ginnetoonna Meshullaam, 17 reer Abiiyaahna Sikrii, reer
Minyaamiinna, reer Moocadyaahna Filtay, 18 reer Bilgaahna
Shammuuca, reer Shemacyaahna Yehoonaataan, 19 reer
Yooyaariibna Matenay, reer Yedacyaahna Cusii, 20 reer
Sallayna Qallay, reer Caamooqna Ceeber, 21 reer Xilqiyaahna
Xashabyaah, reer Yedacyaahna Netaneel. 22 Oo kuwii reer
Laawi oo joogay wakhtigii Eliyaashiib, iyo Yooyaadaac,
iyo Yooxaanaan iyo Yadduuca waxay ahaayeen madaxda
qabiilooyinka oo la qoray; waxaa kaloo la qoray wadaaddadii
joogay ilaa boqornimadii Daariyus kii reer Faaris ahaa. 23
Kuwii reer Laawi oo ahaa madaxdii qabiilooyinka waxaa lagu
qoray kitaabkii taariikhda tan iyo wakhtigii Yooxaanaan oo
ahaa ina Eliyaashiib. 24 Oo kuwii reer Laawi madaxda u
ahaa waxay ahaayeen Xashabyaah, iyo Sheereebyaah, iyo
Yeeshuuca oo ahaa ina Qadmii'eel, iyo walaalahoodii iyaga ka
soo hor jeeday inay Ilaah ammaanaan oo ay u mahadnaqaan,
siduu amray Daa'uud oo ahaa ninkii Ilaah, iyagoo iska
soo hor jeeda. 25 Oo Matanyaah, iyo Baqbuqyaah, iyo
Cobadyaah, iyo Meshullaam, iyo Talmon, iyo Caquub waxay
ahaayeen irid-dhawryadii dhawri jiray bakhaarradii u dhowaa
irdaha. 26 Kuwaasu waxay joogeen wakhtigii Yooyaaqiim
oo ahaa ina Yeeshuuca, ina Yoosaadaaq, iyo wakhtigii
taliyihii Nexemyaah ahaa iyo wakhtigii wadaadkii Cesraa
oo karraaniga ahaa. 27 Oo markii derbigii Yeruusaalem
gaar laga dhigay kuwii reer Laawi mid kasta meeshiisii
baa laga doondoonay in iyaga Yeruusaalem la keeno si
gaarkadhigidda farxad loogu sameeyo, oo mahadnaqid
iyo gabay, iyo suxuun laysku garaaco, iyo shareerado, iyo

kataaradoba Ilaah loogu ammaano. **28** Oo kuwii gabayaaga
ahaana waxay iska soo urursadeen bannaankii Yeruusaalem
ku wareegsanaa iyo tuulooyinkii reer Netofaah, **29** iyo
weliba Beytgilgaal, iyo beerihii Gebac, iyo Casmawed,
waayo, kuwii gabayaaga ahaa tuulooyin ayay ka dhisteen
Yeruusaalem hareeraheeda. **30** Markaasaa wadaaddadii iyo
kuwii reer Laawi isdaahiriyeen, oo waxay kaloo daahiriyeen
dadkii iyo irdihii iyo derbigii. **31** Kolkaasaan amiirradii dalka
Yahuudah keenay derbiga dushiisa, oo waxaan doortay laba
kooxood oo waaweyn oo mahadnaqa, oo kooxba raggeedu
isdaba socdo. Midi waxay tagtay xagga midig derbiga
dushiisa ee Iridda Digada, **32** oo waxaa iyagii daba galay
Hooshacyaah iyo amiirradii dalka Yahuudah badhkood, **33** iyo
Casaryaah, iyo Cesraa, iyo Meshullaam, **34** iyo Yahuudah, iyo
Benyaamiin, iyo Shemacyaah, iyo Yeremyaah, **35** iyo wiilashii
wadaaddada qaarkood oo turumbooyin wata, kuwaasoo
ahaa Sekaryaah oo ahaa ina Yoonaataan, ina Shemacyaah,
ina Matanyaah, ina Miikaayaah, ina Sakuur, ina Aasaaf,
**36** iyo walaalihiis oo ahaa Shemacyaah, iyo Casareel, iyo
Milalay, iyo Gilalay, iyo Maacay, iyo Netoneel, iyo Yahuudah,
iyo Xanaanii, iyagoo wata alaabtii muusikada oo Daa'uud oo
ahaa ninka Ilaah, oo iyaga waxaa u horreeyey karraanigii
Cesraa. **37** Oo xagga Iriddii Isha Biyaha iyo hortoodii ku
qummanayd ayay kor u fuuleen jaranjaradii magaalada
Daa'uud meesha derbiga laga fuulo oo ka korraysa gurigii
Daa'uud, iyo ilaa Iridda Biyaha oo xagga bari ah. **38** Oo
kooxdii kale oo kuwa mahadda naqaa waxay u kaceen
inay ka hor tagaan, oo anna iyagaan daba socday; aniga
iyo dadkii badhkiis waxaannu soconnay derbiga korkiisa,
xagga ka sarraysa Munaaradda Foornooyinka iyo xataa tan
iyo derbiga ballaadhan, **39** iyo xagga ka sarraysa Iridda
Efrayim, iyo Iridda Gabooday agteeda, iyo Iridda Kalluunka,
iyo Munaaradda Xananeel, iyo Munaaradda Mee'aah, iyo
xataa Iridda Idaha; oo waxay joogsadeen Iriddii Waardiyaha.
**40** Oo sidaasay u joogsadeen labadii kooxood oo kuwii
mahadda ku naqi jiray gurigii Ilaah, iyo aniga, iyo taliyayaashii
badhkood oo ila joogay, **41** iyo wadaaddadii ahaa Elyaaqiim,
iyo Macaseeyaah, iyo Minyaamim, iyo Miikaayaah, iyo
Eliyooceenay, iyo Sekaryaah, iyo Xananyaah, oo wata
turumbooyin; **42** iyo Macaseeyaah, iyo Shemacyaah, iyo
Elecaasaar, iyo Cusii, iyo Yehooxaanaan, iyo Malkiiyaah, iyo
Ceelaam, iyo Ceser. Oo kuwii gabayaaga ahaana cod dheer
bay kula gabyeen Yesraxyaah oo ahaa madaxoodii. **43** Oo
maalintaas waxaa la bixiyey allabaryo badan, oo waa la
wada farxay, waayo, Ilaah baa farxad weyn kaga farxiyey, oo
dumarkii iyo carruurtiina way farxeen, sidaas daraaddeed
Yeruusaalem farxaddeedii waxaa laga maqlay meel fog. **44**
Oo maalintaas ayaa rag loo doortay inay u taliyaan qolalka
khasnadaha, iyo qurbaannada kor loo qaado, iyo midhaha
ugu horreeya, iyo meeltobnaadyada, si loogaga soo ururiyo
beeraha magaalooyinka oo dhan qaybihii sharcigu u amray
wadaaddada iyo kuwii reer Laawi, waayo, dadka dalka
Yahuudah way ku faraxsanaayeen wadaaddadii iyo kuwii
reer Laawi oo adeegayay. **45** Oo waxay dhawreen wixii ku
saabsanaa u adeegidda Ilaahood iyo wixii ku saabsanaa
isdaahirinta, oo kuwii gabayaaga ahaa iyo irid-dhawryadiina
saasoo kalay yeeleen, sidii uu amarkii Daa'uud iyo wiilkiisii
Sulaymaan ahaa. **46** Waayo, waagii hore oo ahaa wakhtigii
Daa'uud iyo Aasaaf waxaa jiri jiray nin madax u ahaa kuwii
gabayaaga ahaa, oo waxaa Ilaah loogu gabyi jiray gabayo
ammaan iyo mahadnaqid ah. **47** Oo wakhtigii Serubaabel
iyo wakhtigii Nexemyaah reer binu Israa'iil oo dhammu way
wada bixin jireen qaybihii kuwii gabayaaga ahaa iyo kuwii
irid-dhawryadaba intii maalin kasta loo baahnaan jiray; oo in
bay gooni uga dhigeen reer Laawi, oo reer Laawina in bay
gooni uga dhigeen reer Haaruun.

**13** Oo maalintaas ayay kitaabkii Muuse akhriyeen iyadoo
dadkii maqlayo; oo waxaa laga helay oo ku qornaa
inayan shirka Ilaah weligood soo gelin mid reer Cammoon
ah iyo mid reer Moo'aab ah toona; **2** maxaa yeelay, iyagu
reer binu Israa'iil kalama ayan hor iman cunto iyo biyo toona,
laakiinse waxay u soo kiraysteen Balcaam inuu habaaro
aawadeed, habase ahaatee Ilaaheennu habaarkii wuxuu
u beddelay duco. **3** Oo waxay noqotay markay sharcigii
maqleen inay reer binu Israa'iil ka sooceen dadkii isku
qasnaa oo dhan. **4** Oo waxyaalahaas ka hor wadaadkii
Eliyaashiib oo loo doortay inuu madax u ahaado qolalka
guriga Ilaaheenna ayaa xidhiidh la yeeshay Toobiyaah, **5** oo
wuxuu isagii u hagaajiyey qowlad weyn oo waagii hore la
dhigi jiray qurbaannada hadhuudhka, iyo fooxa, iyo weelasha,
iyo meeltobnaadyada hadhuudhka iyo khamriga iyo saliidda,
oo amar lagu siin jiray kuwa reer Laawi, iyo kuwii gabayaaga
ahaa, iyo irid-dhawryada, iyo qurbaannadii kor loo qaadi
jiray oo la siin jiray wadaaddada. **6** Laakiinse waagaas oo
dhan anigu Yeruusaalem ma aanan joogin, waayo, sannaddii
soddon iyo labaad oo boqorkii Baabuloon ee Artaxshasta
ahaa ayaan u tegey boqorka, oo maalmo yar dabadood ayaan
boqorka fasax weyddiistay. **7** Markaasaan Yeruusaalem
imid oo waxaan gartay sharkii uu Eliyaashiib u sameeyey
Toobiyaah markuu qowlad uga diyaarshay barxadihii guriga
Ilaah. **8** Haddaba taasu aad bay ii murugaysay, sidaas
daraaddeed qowladdii dibaddaan uga wada tuuray alaabtii
guriga Toobiyaah oo dhan. **9** Markaasaan amar bixiyey oo

qolalkii waa la nadiifiyey; oo halkaasaan mar kale ku soo
celiyey weelashii gurigii Ilaah, iyo qurbaannadii hadhuudhka,
iyo fooxii. **10** Oo haddana waxaan kaloo gartay inaan kuwii
reer Laawi qaybahoodii la siin, oo sidaas daraaddeed kuwii
reer Laawi iyo kuwii gabayaaga ahaa oo shuqulka samayn
jirayba way carareen oo mid waluba beertiisii buu tegey. **11**
Markaasaan taliyayaashii la diriray oo waxaan ku idhi, War
maxaa guriga Ilaah looga tegey? Kolkaasaan iyagii soo wada
ururiyey oo meeshoodii ku celiyey. **12** Markaasaa dadka
dalka Yahuudah oo dhammu waxay qolalkii khasnadaha soo
geliyeen meeltobnaadyadii hadhuudhka iyo kuwii khamriga
iyo kuwii saliiddaba. **13** Oo qolalkii khasnadaha waxaan
madax uga dhigay khasnajiyo, oo waxay ahaayeen wadaadkii
Shelemyaah ahaa, iyo karraanigii Saadooq ahaa, oo reer
Laawina waxaa kaga jiray Fedaayaah, oo waxaa ku xigay
Xaanaan ina Sakuur, oo ahaa ina Matanyaah, waayo, waxaa
lagu tiriyey inay aamin yihiin, oo shaqadooduna waxay ahayd
inay walaalahood wax u qaybiyaan. **14** Ilaahayow, haddaba
bal taas daraaddeed ii xusuuso, oo ha tirtirin falimahaygii
wanaagsanaa oo aan u qabtay gurigaaga iyo waxyaalihii
la dhawri lahaa. **15** Oo waagaas waxaan dalka Yahuudah
ku arkay kuwo maalinta Sabtida macsarada canabka ku
tumanaya, oo xidhmooyin soo ururinaya, oo dameerro
raraya, iyo weliba khamri iyo canab, iyo berde iyo rar cayn
kasta ah oo Yeruusaalem la soo gelinaya maalinta sabtida;
oo anna iyagii waan uga digay maalintii ay cuntada iibiyeen.
**16** Oo halkaas waxaa kaloo degganaa dad reer Turos ah
oo keeni jiray kalluun iyo alaab cayn kasta ah, oo maalinta
ayay ka iibin jireen dadka dalka Yahuudah iyo Yeruusaalem
gudaheeda. **17** Markaasaan la diriray kuwii gobta ahaa
oo dalka Yahuudah oo waxaan ku idhi, War waa maxay
waxan sharka ah oo aad samaysaan oo aad ku nijaasaysaan
maalinta sabtida ah? **18** War sow awowayaashiin saasoo kale
ma yeelin, sow Ilaah belaayadan oo dhan taas aawadeed
inooguma soo dejin innaga iyo magaaladaba? Oo weliba
markaad sabtida nijaasaysaan waxaad reer binu Israa'iil
ku soo dejisaan cadho kale oo badan. **19** Oo sabtida ka
hor markii irdihii Yeruusaalem soo madoobaanayeen, ayaan
amray in albaabbada la xidho, oo waxaan kaloo amray inaan
la furin jeeray sabtidu dhammaato; oo qaar midiidinnadaydii
ah ayaan irdihii waardiye uga dhigay inaan maalinta sabtida
waxba rar la soo gelin. **20** Haddaba baayacmushtariyaashii
iyo kuwii alaab cayn kasta iibin jiray mar iyo laba ayay
Yeruusaalem dibaddeeda u hoydeen. **21** Markaasaan iyagii
u digay oo ku idhi, War maxaad derbiga hareerihiisa ugu
hoyataan? Haddaad mar dambe saas yeeshaan gacan
baan idin saarayaa. Oo ayaantaas ka dib mar dambe ma
ay iman maalin sabti ah. **22** Oo waxaan kuwii reer Laawi
ku amray inay isdaahiriyaan iyo inay yimaadaan oo irdaha
dhawraan si ay quduus uga dhigaan maalinta sabtida.
Ilaahayow, taas aawadeedna ii xusuuso, oo iigu tudh siday
weynaanta naxariistaadu tahay. **23** Oo waagaas waxaan
kaloo arkay Yuhuuddii oo guursatay naago ah reer Ashdood,
iyo reer Cammoon, iyo reer Moo'aab. **24** Oo carruurtoodii
badhkoodna waxay ku hadli jireen afkii reer Ashdood, oo
afkii Yuhuuddana kuma ay hadli karin, laakiinse waxay ku
hadli jireen sidii afkii dadyow kasta. **25** Oo anna iyagii waan
la diriray, waanan caayay, oo qaarkoodna waan dilay, oo
timahoodiina waan ka rifay, waanan ku dhaarshay Ilaah, oo
ku idhi, Waa inaydnaan gabdhihiinna u guurin wiilashooda,
gabdhahoodana ha u guurinina wiilashiinna, idinkuna ha
guursanina. **26** War Sulaymaan oo ahaa boqorkii reer binu
Israa'iil sow isba waxyaalahan kuma dembaabin? In kastoo
aan quruumo badan dhexdooda boqor isagoo kala ah laga
heli karin, oo uu Ilaahiisuna jeclaa, oo uu Ilaah ka dhigay
boqor u taliya reer binu Israa'iil oo dhan, haddana xataa isagii
waxaa dembaajiyey naago qalaad. **27** Haddaba miyaannu
idin dhegaysannaa si aannu sharkan oo dhan u samayno oo
intaan naago qalaad guursanno miyaannu Ilaahayaga ku
xadgudubnaa? **28** Oo Eliyaashiib oo ahaa wadaadkii sare
wiilashiisii midkood oo Yooyaadaac ahaa waxaa soddog u
ahaa Sanballad oo ahaa reer Xoron; oo sidaas daraaddeed
ayaan isaga eryay. **29** Ilaahayow, iyaga xusuuso, maxaa
yeelay, waxay nijaaseeyeen wadaadnimadii, iyo axdigii
wadaadnimada iyo kii reer Laawi. **30** Haddaba sidaasaan
uga nadiifiyey dad kasta oo qalaad, oo waxaan bixiyey
amar ku saabsan wadaaddadii iyo kuwii reer Laawiba iyo
mid walba shuqulkiisii, **31** iyo amar ku saabsan qurbaankii
qoryaha oo wakhtiyada la amray la keeno, iyo midhaha ugu
horreeya. Ilaahayow, wanaag igu xusuuso.

# Esteer

1 Wakhtigii Ahashwerus (Ahashweruskaasu wuxuu ahaa
kii xukumi jiray Hindiya iyo Itoobiya inta ka dhex leh, oo u
talin jiray boqol iyo toddoba iyo labaatan gobol) 2 markii
Boqor Ahashwerus uu ku fadhiistay carshigii boqortooyadiisa
oo ku yiil Shuushan oo ahayd hoygii boqorka, 3 sannaddii
saddexaad oo boqornimadiisa ayuu martiqaad u sameeyey
amiirradiisii iyo addoommadiisii oo dhan, taas oo ay hortiisa
joogeen xooggii Faaris iyo Maaday, iyo dadkii gobta ahaa
iyo amiirradii gobollada. 4 Oo wuxuu soo bannaan dhigay
maalkii boqortooyadiisa ammaanta badnayd, iyo sharaftii
haybaddiisa sarraysa, intii maalmo badan ah oo gaadha
boqol iyo siddeetan maalmood. 5 Oo markii maalmahaasu
dhammaadeen ayuu boqorku diyaafad u sameeyey dadkii
Shuushan oo hoygii boqorka ahayd joogay oo dhan, yar iyo
weynba, intii toddoba maalmood ah, oo diyaafaddiina waxaa
lagu dhigay barxaddii beerta ku dhex tiil hoygii boqorka.
6 Oo waxaa meeshaas ka laalaaday daahyo ah caddaan
iyo cagaar iyo buluug, oo waxaa ku xidhnaa xadhko laga
sameeyey maro wanaagsan iyo dhar guduudan oo sudhan
siddooyin lacag ah iyo tiirar marmar ah. Sariiruhuna waxay
ahaayeen dahab iyo lacag, oo waxaa la dhigay meel siman
oo laga sameeyey marmar ah casaan iyo caddaan iyo
huruud iyo madow. 7 Oo waxaa dadka cabniin lagu siiyey
weelal dahab ah (oo weelashana midba midka kale wuu
ka duwanaa), oo khamrigii boqorkuna wuu badnaa sidii ay
ahayd deeqsinimadii boqorku. 8 Oo cabniinkuna wuxuu
waafaqsanaa qaynuunka, dirqina ma jirin, waayo, boqorku
wuxuu madaxdii gurigiisa oo dhan ku amray inay nin kasta u
yeelaan siduu doonayo. 9 Oo weliba Boqorad Washtiina
waxay dumarkii diyaafad ugu samaysay hoygii reer boqor oo
uu Boqor Ahashwerus lahaa. 10 Oo maalintii toddobaad
boqorkii, isagoo qalbigiisu khamri ku faraxsan yahay, wuxuu
amray toddobadii midiidin oo Boqor Ahashwerus ka adeegi
jiray oo ahaa Mehuumaan, Bista, Xarboona, Bigtaa, Abagta,
Seetar, iyo Karkas, 11 oo wuxuu iyagii ku amray inay
Boqorad Washtii hortiisa keenaan, iyadoo qabta taajkii
boqornimada, si quruxdeeda loo tuso dadka iyo amiirrada,
waayo, iyadu waxay lahayd suurad wanaagsan oo in la
fiirsado ku fiican. 12 Laakiinse boqoraddii Washtii ahayd
way diidday inay ku timaado amarkii boqorku ugu soo
dhiibay midiidinnada. Sidaas daraaddeed boqorkii aad buu u
xanaaqay, oo cadhadiisiina wuu la gubtay. 13 Markaasaa
boqorkii wuxuu la hadlay nimankii xigmadda lahaa oo
xilliyada yiqiin, (waayo, boqorka caadadiisu saasay ahayd
xagga kulli kuwii sharcigii yiqiin iyo xukunkaba, 14 oo
waxaa isaga ku xigay Karshena, Shetaar, Admata, Tarshiish,
Meres, Marsena, iyo Memuukaan oo ahaa toddobadii amiir
oo Faaris iyo Maaday, oo arkay boqorka wejigiisa, oo
fadhiyey boqortooyada derejadeeda kowaad), 15 oo wuxuu
ku yidhi, War maxaan ku samaynaa Boqorad Washtii sida
sharciga waafaqsan? Maxaa yeelay, iyadu ma ay yeelin
yeedhiddii Boqor Ahashwerus iyada midiidinnada ugu sii
dhiibay. 16 Markaasaa Memuukaan jawaabay, oo wuxuu
boqorkii iyo amiirradii hortooda ka yidhi, Boqorad Washtii
boqorka oo keliya ma ay xumayn, laakiinse waxay xumaysay
amiirrada oo dhan, iyo dadka deggan Boqor Ahashwerus
gobolladiisa oo dhan. 17 Haddaba wixii ay boqoraddu
samaysay wuu wada gaadhi doonaa dumarka oo dhan,
kolkaasay nimankooda quudhsan doonaan markii warkan
loo sheego, oo lagu yidhaahdo, Boqorkii Ahashwerus wuxuu
amray in Boqorad Washtii hortiisa la keeno, laakiinse ma ay
iman. 18 Haddaba isla maantadan amiiradaha Faaris iyo
Maaday oo maqlay wixii ay boqoraddu samaysay, sidaasoo
kalay ku odhan doonaan boqorka amiirradiisa oo dhan.
Oo saas aawadeed waxaa kici doona quudhsasho iyo
xanaaq badan. 19 Haddaba haddii boqorku raalli ka yahay,
amar boqornimo ha bixiyo, oo amarkaasna si aan loo
beddelin ha lagu dhex qoro qaynuunnada reer Faaris iyo reer
Maaday, inaanay boqoradda Washtii mar dambe iman Boqor
Ahashwerus hortiisa. Boqorkuna boqoradnimadeedii ha siiyo
mid kale oo iyada ka wanaagsan. 20 Oo marka boqorka
amarkiisa uu bixin doono lagu faafiyo boqortooyadiisa oo
dhan (waayo, way weyn tahay) ayaa dumarka oo dhammu
nimankooda maamuusi doonaan, yar iyo weynba. 21 Oo
odhaahdaasu waxay ka farxisay boqorkii iyo amiirradii oo
dhanba, kolkaasuu boqorkii yeelay sidii uu Memuukaan
yidhi. 22 Oo wuxuu warqado u diray boqorka gobolladiisii
oo dhan, oo gobol walba wuxuu ugu qoray fartiisii, oo dad
kastana wuxuu ugu qoray afkoodii, si nin kastaa ugu taliyo
reerkiisa oo uu ku sheego afka dadkiisu ku hadlo.

2 Oo waxyaalahaas dabadood markii Boqor Ahashwerus
cadho baxay ayuu soo xusuustay Washtii, iyo wixii ay
samaysay, iyo wixii iyada ka geesta ahaa oo la amray. 2
Markaasaa boqorka midiidinnadiisii u adeegi jiray waxay
yidhaahdeen, Boqorka ha loo doondoono bikrado qurux
badan oo dhallinyaro ah; 3 oo boqorku gobol kasta oo
boqortooyadiisa ka mid ah ha ka dhex doorto wakiillo, si ay
bikradaha quruxda badan oo dhallinyarada ah oo dhan ugu
soo ururiyaan Shuushan oo ah hoyga boqorka, oo iyaga ha
keeneen guriga naagaha, oo gacanta ha u geliyeen Heegay
oo ah midiidinka boqorka naagaha u dhawra, oo iyaga ha la

siiyo alaabtoodii ay isku daahirin lahaayeen. 4 Oo gabadhii
boqorka la wanaagsanaata, meeshii Washtii boqorad ha ka
noqoto. Oo waxaasuna boqorka way ka farxiyeen; kolkaasuu
saas yeelay. 5 Oo Shuushan oo hoygii boqorka ahaa waxaa
jiray nin Yuhuud ah, oo magiciisana waxaa la odhan jiray
Mordekay ina Ya'iir, ina Shim'i, ina Qiish, oo wuxuu ahaa reer
Benyaamiin; 6 oo isaga waxaa mar hore laga soo kaxaystay
Yeruusaalem, wuxuuna la socday maxaabiistii lala soo
kaxaystay Yekonyaah oo ahaa boqorkii reer Yahuudah, oo uu
soo kaxaystay Nebukadnesar oo ahaa boqorkii Baabuloon.
7 Oo isagu wuxuu soo koriyey Hadasaah, taasoo ahayd ina-
adeertiis Esteer, waayo, iyadu aabbe iyo hooyo toona ma
ay lahayn; gabadhuna way suurad wacnayd, wayna qurux
badnayd; oo markii aabbeheed iyo hooyadeed dhinteen ayaa
Mordekay qaatay oo sidii gabadhiisii ka dhigtay. 8 Markii la
maqlay boqorka amarkiisii iyo naadadiisii, kolkii hablo badan
lagu soo ururiyey Shuushan oo ahayd hoygii boqorka, oo
gacanta loo geliyey Heegay, ayaa Esteer la geeyey gurigii
boqorka, oo waxaa gacanta loo geliyey Heegay oo ahaa kii
naagaha dhawri jiray. 9 Oo gabadhii way la wanaagsanaatay
isagii, wuuna u roonaaday; oo markiiba wuxuu iyadii siiyey
alaabteedii isdaahirinta, iyo intii ay qaybta u lahayd, iyo
toddoba gabdhood oo ay waajib u lahayd in laga siiyo
guriga boqorka. Markaasuu iyadii iyo gabdhaheediiba geeyey
meeshii ugu wanaagsanayd guriga naagaha. 10 Esteerna
ma ay sheegin dadkeedii iyo qoladeedii toona; waayo, waxaa
Mordekay ku amray inaanay waxba sheegin. 11 Mordekayna
wuxuu maalin kasta mari jiray barxadda guriga naagaha
horteeda si uu ku ogaado Esteer nabadqabkeeda iyo waxa
iyada ku dhici lahaa. 12 Haddaba markii gabadh walba
wakhtigeedii la gaadhay inay u gasho Boqor Ahashwerus,
oo iyada loogu sameeyo sida waafaqsan waxa sharcigu
dumarka farayo laba iyo toban bilood dabadeed, (waayo,
saasaa isdaahirintoodu ku dhammaan jirtay, inay intii lix
bilood ah ismariyaan saliidda malmalka, intii lix bilood ahna
ismariyaan uunsi udgoon iyo waxyaalaha dumarka lagu
daahiriyo) 13 ayaa sidaas gabadhii boqorkii ugu timid,
oo wax alla wixii ay doonaysay inay guriga naagaha ka
qaadato, oo ay la tagto guriga boqorka, dhammaantood
waa la siiyey iyada. 14 Oo iyadu fiidkii bay tagtay, oo
subaxdii ayay ku soo noqotay gurigii labaad oo naagaha, iyo
gacanta Shacashgas oo ahaa boqorka midiidinkiisii u dhawri
jiray naagaha addoommaha ah. Iyana mar dambe boqorkii
uma ay soo gelin, in boqorku ku farxo iyo in magaceeda
loogu yeedho mooyaane. 15 Haddaba Esteer oo ahayd ina
Abiixayil, kaasoo adeer u ahaa Mordekay oo iyada qaatay
oo ka dhigtay sidii gabadhiisii oo kale, markii wakhtigeedii
ay boqorka u geli lahayd la gaadhay, iyadu waxba ma ay
dalban wixii Heegay oo ahaa boqorka midiidinkiisii naagaha
u dhawri jiray uu u dooray mooyaane. Oo intii Esteer aragtay
oo dhammu way u bogeen. 16 Haddaba boqorka sannaddiisii
toddobaad ee boqornimadiisa, bisheedii tobnaad oo ahayd
bisha Tebed ayaa Esteer loogu geeyey Boqor Ahashwerus
gurigiisii boqornimada. 17 Haddaba boqorkii Esteer buu ka
jeclaaday naagihii kale oo dhan, oo iyana waxay isagii ka
heshay raxmad iyo roonaan ka sii badan intii ay bikradaha
kale heleen oo dhan; oo sidaas daraaddeed ayuu madaxa
u saaray taajkii boqornimada, oo meeshii Washtii ayuu
iyada boqorad uga dhigay. 18 Markaasaa boqorkii martiqaad
weyn u sameeyey amiirradiisii iyo addoommadiisii oo dhan,
taasuna waxay ahayd martiqaad Esteer loo sameeyey; oo
gobolladiina boqorku wuu nasiyey, oo hadiyadona wuxuu u
bixiyey sidii deeqsinimadiisii ahayd. 19 Oo markii bikradihii
mar labaad la soo ururiyey ayaa Mordekay soo fadhiistay
boqorka iriddiisii. 20 Oo Esteerna weli ma ay sheegin
qoladeedii iyo dadkeedii toona, sidii Mordekay ku amray;
waayo, Esteer amarkii Mordekay bay u addeeci jirtay sidii
markii uu korinayay oo kale. 21 Oo waagaas mar uu
Mordekay boqorka iriddiisa fadhiistay ayaa waxaa aad u
cadhooday laba nin oo boqorka midiidinno u ahaa, waxayna
ahaayeen Bigtaan iyo Teresh oo ka mid ahaa kuwa iridda
dhawra, oo waxay dooneen inay Boqor Ahashwerus dilaan.
22 Oo xaalkaas waxaa ogaaday Mordekay, kolkaasuu u
sheegay Boqorad Esteer; Esteerna waxay u sheegtay
boqorkii, iyadoo ku hadlaysa Mordekay magiciisa. 23 Oo
markii xaalkaas la baadhay ayaa waxaa la ogaaday inay
saas tahay, oo labadoodiiba geed baa laga soo deldelay;
oo taasna waxaa lagu qoray buuggii taariikhda boqorka
hortiisa.

**3** Oo waxyaalahaas dabadeed Boqor Ahashwerus wuxuu
dalliciyey oo kursigiisii ka sarraysiiyey amiirradii isaga
la joogay oo dhan Haamaan ina Hamedaata oo ahaa reer
Agag, oo isaga wuu hore mariyey. 2 Oo waxaa Haamaan u
foororsaday oo u sujuuday boqorka addoommadiisii iriddiisa
joogay oo dhan, waayo, boqorka ayaa in saas loo yeelo
amray. Laakiinse Mordekay uma uu foororsan, umana
sujuudin. 3 Markaasaa addoommadii boqorka oo joogay
boqorka iriddiisa waxay Mordekay ku yidhaahdeen, War
maxaad u jebinaysaa boqorka amarkiisa? 4 Haddaba waxaa
dhacday, markay maalin kasta saas ku lahaayeen, laakiinse
isagu uusan dheg u dhigin, inay warkaas Haamaan u
sheegeen inay arkaan bal wuxuu xaalka Mordekay noqdo,
waayo, wuxuu iyagii u sheegay inuu Yuhuud yahay. 5

Haamaanna markuu arkay inaan Mordekay u foororsan
oo aanu u sujuudin, ayuu Haamaan aad u cadhooday.
6 Laakiinse wuu quudhsaday inuu Mordekay oo qudha
gacanta saaro, waayo, waxaa isaga loo sheegay Mordekay
qabiilkiisa; oo sidaas daraaddeed Haamaan wuxuu doonayay
inuu wada baabbi'iyo Yuhuudda boqortooyada Ahashwerus
deggan oo dhan, kuwaasoo ahaa Mordekay qabiilkiisii.
7 Oo sannaddii laba iyo tobnaad oo Boqor Ahashwerus,
bisheedii kowaad taasoo ah bisha Niisaan ayay Haamaan
hortiisa ku rideen saami magiciisa la yidhaahdo Fuur, oo
taasuna waxay socotay maalin ka maalin, iyo bil ka bil, ilaa
bishii laba iyo tobnaad oo ah bisha Adaar. 8 Markaasaa
Haamaan wuxuu Boqor Ahashwerus ku yidhi, Waxaa jira
dad ku wada dhex firidhsan dadyowga deggan gobollada
boqortooyadaada oo dhan, qaynuunnadooduna way ka
wada duwan yihiin kuwa dadyowga kale oo dhan. Iyaguna
qaynuunnada boqorka ma dhawraan. Sidaas daraaddeed,
boqorow, inaad iska daysid faa'iido kuugu ma jirto. 9
Haddaba, boqorow, taas haddaad raalli ka tahay, ha la qoro
in iyaga la baabbi'iyo; oo anna waxaan bixin doonaa toban
kun oo talanti oo lacag ah, oo waxaan gacanta u gelin doonaa
kuwa boqorka shuqulkiisa u taliya inay iyagu maalkaas
geliyaan khasnadaha boqorka. 10 Markaasaa boqorkii wuxuu
gacantiisa ka siibay kaatunkiisii oo wuxuu siiyey Haamaan
ina Hamedaata oo ahaa reer Agag ee weliba ahaa cadowgii
Yuhuudda. 11 Kolkaasaa boqorkii wuxuu Haamaan ku yidhi,
Lacagta adigaa lagu siiyey, oo weliba dadkana waxaad
ku samaysaa wax alla wixii kula wanaagsan. 12 Oo bishii
kowaad maalinteedii saddex iyo tobnaad ayaa loo wada
yeedhay boqorka karraaniyadiisii oo dhan, oo waxaa la
qoray kulli wixii Haamaan ku amray boqorka saraakiishiisii
iyo taliyayaashii gobollada oo dhan xukumayay, iyo amiirradii
u talinayay dad kasta, oo gobol kasta waxaa loogu qoray
afkiisii. Oo waxaa lagu qoray Boqorka Ahashwerus magiciisa,
waxaana lagu shaabadeeyey boqorka kaatunkiisii. 13 Oo
warqadona waxaa loo dhiibay warqaadayaal, oo waxaa
loo diray boqorka gobolladiisii oo dhan, in Yuhuudda oo
dhan la wada baabbi'iyo, oo la wada laayo, oo la halaago
dhammaantood, yar iyo weyn, iyo dhallaanka iyo dumarkaba,
bisha Adaar oo ah bisha laba iyo tobnaad, maalinteeda
saddex iyo tobnaad, iyo in maalkoodana booli ahaan loo
dhaco. 14 Oo waxaa dadyowga oo dhan lagu dhex faafiyey
warqaddii la qoray naqilkeedii, oo leh amar ha la wada siiyo
gobollada oo dhan inay diyaar u noqdaan maalintaas. 15 Oo
warqaadayaashiina haddiiba degdeg bay ugu ambabbexeen
boqorka amarkiisii, oo Shuushan oo ahayd hoygii boqorkana
amarkii waa lagu bixiyey. Haddaba boqorkii iyo Haamaan
waxay u fadhiisteen inay wax cabbaan; laakiinse magaaladii
Shuushan oo dhammu way ka wareertay.

4 Haddaba markii Mordekay ogaaday wixii la sameeyey oo
dhan ayuu dharkiisii jeexjeexay, dhar joonyad ahna wuu
xidhay oo dambas ismariyey, markaasuu magaalada dhex
galay oo oohin dheer oo qadhaadh ku qayliyey. 2 Wuxuuna
hor yimid boqorka iriddiisa; waayo, ninna iridda boqorka ma
geli karayn isagoo dhar joonyad ah qaba. 3 Oo gobol kasta oo
qaynuunkii iyo amarkii boqorku gaadhayba waxaa Yuhuuddii
ka dhex dhacday baroor weyn, iyo soon, iyo oohin, iyo qaylo;
kuwo badanuna dambas bay ku jiifeen iyagoo dhar joonyad
ah qaba. 4 Markaasaa Esteer waxaa u yimid oo xaalkaas u
soo sheegay gabdhaheedii iyo midiidinnadeedii; kolkaasay
boqoraddii aad iyo aad u murugootay; oo Mordekay ayay u
sii dirtay dhar uu xidho, waxayna u sheegtay inuu dharkiisii
joonyadda ahaa iska furo; laakiinse dharkii ma uu qaadan.
5 Markaasaa Esteer waxay u yeedhay Hatag oo boqorka
midiidinnadiisa ka mid ahaa oo uu boqorku u doortay inuu u
adeego, oo waxay isagii ku amartay inuu Mordekay u tago
oo uu soo ogaado bal waxa xaalkanu ahaa, iyo wuxuu u
dhacayba. 6 Sidaas daraaddeed Hatag wuxuu Mordekay
ugu tegey magaalada bannaankeedii ka soo hor jeeday
boqorka iriddiisa. 7 Markaasaa Mordekay wuxuu isagii u
sheegay dhammaan wixii isaga ku dhacay, iyo lacagtii uu
Haamaan u ballanqaaday inuu siinayo boqorka khasnadihiisa
in Yuhuudda la baabbi'iyo aawadeed. 8 Oo weliba wuxuu
isagii u dhiibay naqilka warqaddii oo amarku ku qornaa oo
Shuushan lagu faafiyey si Yuhuudda loo wada baabbi'iyo,
wuxuuna taas u siiyey inuu Esteer tuso oo uu iyada u
warramo, oo wuxuu iyada ku amray inay boqorka u gasho, oo
ay barido oo ay isaga hortiisa wax ka weyddiisato dadkeeda
aawadiis. 9 Kolkaasaa Hatag yimid oo wuxuu Esteer u
sheegay erayadii Mordekay. 10 Dabadeedna Esteer baa la
hadashay Hatag oo waxay farriin ugu sii dhiibtay Mordekay
oo ku tidhi, 11 Boqorka addoommadiisa oo dhan iyo dadka
boqorka gobolladiisa deggan oo dhammu way wada og yihiin
in ku alla kii, isagoo aan loo yeedhin, boqorka ugu soo gala
barxadda dhexe, ama nin ha ahaado ama naag ha ahaatee,
qaynuun baa loo hayaa, waana in isaga la dilo, haddaan
boqorku usha dahabka ah fidin, si uu u noolaado aawadeed;
laakiinse aniga la iima yeedhin inaan boqorka u soo galo
intii soddon maalmood ah. 12 Kolkaasaa Mordekay loo
soo sheegay Esteer erayadeedii. 13 Markaasuu Mordekay
iyagii jawaab ugu sii dhiibay Esteer, oo wuxuu ku yidhi, Ha
moodin inaad adiga qudhaadu guriga boqorka ku baxsan
doontid iyadoo aanay Yuhuudda ka baxsan. 14 Waayo,

haddaad wakhtigan iska aamustid, waxaa Yuhuudda meel
kale uga kici doona furasho iyo samatabbax, laakiinse adiga
iyo reerka aabbahaaba waad halligmi doontaan. Bal yaase
garanaya inaad wakhtigan oo kale daraaddiis boqortooyada
u soo gashay? 15 Markaasaa Esteer waxay iyaga u sheegtay
inay Mordekay jawaab ku celiyaan, oo waxay ku tidhi, 16
Tag, oo soo wada ururi Yuhuudda Shuushan joogta oo
dhan, oo ii sooma, oo intii saddex maalmood ah, habeen
iyo maalin toona, waxba ha cunina, waxna ha cabbina; oo
aniga iyo gabdhahayguna sidaas oo kalaan u soomaynaa;
oo kolkaasaan boqorka u gelayaa, taasoo aan sharciga
waafaqsanayn; oo haddii aan halligmona, waan halligmayaa.
17 Markaasuu Mordekay iska tegey oo sameeyey wax alla
wixii Esteer ku amartay oo dhan.

5 Haddaba maalintii saddexaad Esteer baa gashatay
dharkeedii boqornimada, oo waxay soo istaagtay guriga
boqorka barxaddiisa dhexe, taasoo ka soo hor jeedday
guriga boqorka; oo boqorkuna wuxuu ku fadhiyey carshigiisii
boqornimada oo ku dhex yiil guriga boqornimada, wuxuuna
ka soo hor jeeday iridda guriga laga soo galo. 2 Oo
markii boqorkii arkay Boqorad Esteer oo barxadda dhex
taagan ayuu raalli ka noqday iyada, oo boqorkiina wuxuu
Esteer ku soo fidiyey ushii dahabka ahayd oo gacantiisa ku
jirtay. Markaasaa Esteer soo dhowaatay oo taabatay usha
dusheedii. 3 Kolkaasuu boqorkii ku yidhi, Boqorad Esteeray,
maxaad doonaysaa? Oo maxaad i weyddiisanaysaa? Xataa
hadday boqortooyada badhkeed tahay waa lagu siinayaaye.
4 Kolkaasaa Esteer waxay tidhi, Boqorow, hadday kula
wanaagsan tahay, maanta adiga iyo Haamaanba kaalaya
martiqaadka aan u diyaariyey. 5 Markaasaa boqorkii
wuxuu yidhi, Haamaan haddiiba ha dhaqsado, si loo yeelo
waxay Esteer tidhi. Oo sidaas daraaddeed boqorkii iyo
Haamaanba waxay yimaadeen martiqaadkii ay Esteer u
diyaarisay. 6 Oo intii martiqaadkii khamriga la joogay ayuu
boqorkii Esteer ku yidhi, Baryadaadu waa maxay? Maxaad i
weyddiisanaysaa? Xataa hadday boqortooyada badhkeed
tahay waa laguu yeelayaaye. 7 Markaasaa Esteer jawaabtay
oo tidhi, Baryadayda iyo weyddiisashadaydu waxay tahay,
8 Boqorow, haddaad raalli iga tahay, oo aad ku faraxdid
inaad ii samaysid waxaan kaa baryay, oo aad yeeshid
waxaan ku weyddiistay, haddaba adiga iyo Haamaan kaalaya
martiqaadka aan idiin diyaarin doono, oo aniguna berri baan
yeelayaa sidaad tidhi, boqorow. 9 Markaasaa Haamaan
maalintaas wuxuu dibadda u baxay isagoo faraxsan oo
qalbiga ka rayraynaya. Laakiinse Haamaan markuu arkay
Mordekay oo jooga boqorka iriddiisa, oo aan isaga u istaagin,
una gariirin, ayuu Mordekay aad iyo aad ugu cadhooday. 10
Habase ahaatee Haamaan wuu isceliyey oo gurigiisuu tegey.
Markaasuu u cid dirsaday oo u yeedhay saaxiibbadiis iyo
naagtiisii Seresh. 11 Markaasaa Haamaan wuxuu iyagii uga
sheekeeyey ammaanta maalkiisa, iyo badnaanta carruurtiisa,
iyo kulli derejadihii boqorku isaga u dalliciyey oo dhan, iyo
sidii boqorku ugu wada sarraysiiyey boqorka amiirradiisa iyo
addoommadiisa oo dhan. 12 Oo Haamaan weliba wuxuu
kaloo yidhi, Xataa boqoradda Esteer ninna uma ay oggolaan
inuu boqorka u soo raaco martiqaadkii ay diyaarisay aniga
mooyaane; oo weliba berrina anigoo boqorka la jira ayay
i martiqaadday. 13 Laakiinse waxaas oo dhammu waxba
ii tari maayaan intaan arkayo Yuhuudiga Mordekay oo
boqorka iriddiisa fadhiya. 14 Markaasaa naagtiisii Seresh
iyo saaxiibbadiis oo dhammu waxay ku yidhaahdeen, Ha
la sameeyo qori wax lagu deldelo oo dhererkiisu konton
dhudhun yahay, oo subaxda waxaad boqorka ku tidhaahdaa,
Mordekay meeshaas ha lagu deldelo. Oo markaas dabadeed
adigoo faraxsan boqorka martiqaadka u raac. Kolkaasaa
hadalkaasu ka farxiyey Haamaan; oo wuxuu amray in
meeshii deldelaadda la sameeyo.

6 Habeenkaasna boqorkii wuu seexan kari waayay,
kolkaasuu amray in loo keeno buuggii taariikhda
wakhtigaas, oo waxaa lagu akhriyey boqorka hortiisa. 2 Oo
waxaa laga dhex helay oo ku qornaa in Mordekay sheegay
Bigtaan iyo Teresh oo ahaa boqorka labadiisii midiidin oo ka
mid ahaa kuwii iridda dhawri jiray, kuwaas oo doonay inay
Boqor Ahashwerus dilaan. 3 Markaasaa boqorkii wuxuu yidhi,
Taas aawadeed maxaa maamuus iyo derejo ah oo Mordekay
loo sameeyey? Kolkaasaa addoommadii boqorka u adeegi
jiray waxay isagii ku yidhaahdeen, Waxba looma samayn.
4 Markaasaa boqorkii wuxuu yidhi, Yaa barxadda jooga?
Haddaba Haamaan ayaa yimid guriga boqorka barxaddiisa
dibadda ah inuu boqorka kala hadlo in Mordekay lagu deldelo
qorigii deldelaadda oo uu isaga u diyaariyey. 5 Markaasaa
boqorka addoommadiisii waxay isaga ku yidhaahdeen, Bal
eeg, Haamaan baa taagan barxadda. Kolkaasaa boqorkii
yidhi, Ha soo galo. 6 Markaasuu Haamaan soo galay,
oo boqorkii wuxuu ku yidhi, Ninkii boqorku ku farxo inuu
maamuuso maxaa loo yeelaa? Haddaba Haamaan wuxuu
qalbigiisa iska yidhi, Bal yaa boqorku ku farxi lahaa inuu
maamuuso in ka badan intuu i maamuuso? 7 Oo Haamaan
wuxuu boqorkii ku yidhi, Ninkii boqorku ku farxo inuu
maamuuso 8 ha loo keeno dharkii boqornimada oo boqorku
xidhan jiray, iyo faraska boqorku fuulo, oo madaxana ha
loo saaro taajka boqorka, 9 oo dharka iyo faraska gacanta
ha loo geliyo boqorka amiirradiisa sharafta leh midkood,

in loo lebbiso ninkii boqorku ku farxo inuu maamuuso. Oo
isaga inta faras la fuushiiyo, jidka magaalada dhexdeeda ha
la mariyo, oo hortiisa ha laga naadiyo, Ninkii boqorku ku
farxo inuu maamuuso sidaasaa loo yeelaa. 10 Markaasaa
boqorkii wuxuu Haamaan ku yidhi, Haddaba soo dhaqso,
oo waxaad soo qaaddaa dharkii iyo faraskii aad sheegtay,
oo wixii aad sheegtay oo dhan u samee Mordekay oo ah
Yuhuudiga fadhiya boqorka iriddiisa; oo wixii aad sheegtay
oo dhan yaan waxba ka dhinnaan. 11 Kolkaasaa Haamaan
wuxuu soo qaaday dharkii iyo faraskii oo wuxuu u lebbisay
Mordekay, oo isagoo faraskii fuushan ayuu mariyey jidka
magaalada, oo wuxuu hortiisa ka naadiyey, Sidaasaa loo
yeelaa ninkii boqorku ku farxo inuu maamuuso. 12 Haddaba
Mordekay wuxuu mar kale ku soo noqday boqorka iriddiisii.
Laakiinse Haamaan isagoo murugaysan oo hagoogan ayuu
gurigiisii dhaqso u tegey. 13 Markaasaa Haamaan wuxuu
naagtiisii Seresh iyo saaxiibbadiis oo dhan uga sheekeeyey
wixii isaga ku dhacay oo dhan. Kolkaasaa raggiisii xigmadda
lahaa iyo naagtiisii Seresh waxay ku yidhaahdeen, Mordekay
oo aad bilowday inaad hortiisa ku dhacdo, hadduu yahay
farcanka Yuhuudda, ka adkaan maysid, laakiinse hubaal
hortiisaad ku dhici doontaa. 14 Oo weliba intay isagii la sii
hadlayeen waxaa yimid boqorka midiidinnadiisii, oo u soo
dhaqsaday inay haddiiba Haamaan keenaan martiqaadkii
Esteer diyaarisay.

**7** Haddaba boqorkii iyo Haamaan waxay u yimaadeen
inay Boqorad Esteer martiqaadkeedii ka qayb galaan. 2
Oo haddana maalintii labaad intii la fadhiyey martiqaadkii
khamriga ayaa boqorkii Esteer ku yidhi, Boqorad Esteeray,
baryadaadu waa maxay? Waa lagu siinayaaye. Maxaad i
weyddiisanaysaa? Xataa hadday boqortooyada badhkeed
tahay, waa laguu yeelayaaye. 3 Markaasaa Boqorad Esteer
jawaabtay oo waxay tidhi, Boqorow, haddaad raalli iga tahay
oo aad ku faraxdid, baryadayda aawadeed naftayda ha la ii
bixiyo, oo weyddiisashadayda aawadeedna dadkaygu ha
ii badbaado, 4 waayo, aniga iyo dadkaygiiba waxaa loo
iibiyey in nala baabbi'iyo, oo nala laayo oo aan halaaganno.
Laakiinse haddii naloo iibiyey inaan ahaanno rag iyo dumar
addoommo ah, waan iska aamusi lahaa, in kastoo cadowgu
aanu boqorka khasaaradiisa ka xaq marin karin. 5 Markaasaa
Boqor Ahashwerus wuxuu Boqorad Esteer ku yidhi, Yuu
yahay, xaggee buuse joogaa, kan ku dhaca oo qalbigiisa
sidaas kaga fikiray inuu waxaas yeelo? 6 Markaasaa Esteer
waxay tidhi, Cadow iyo col waxaa ah Haamaankan sharka
leh. Markaasaa Haamaan boqorkii iyo boqoraddii hortooda ku
cabsaday. 7 Kolkaasaa boqorkii isagoo cadhaysan, ka kacay
martiqaadkii khamriga, oo wuxuu u baxay xagga beerta
hoyga boqorka; oo Haamaan ayaa u istaagay inuu Boqorad
Esteer naftiisa u baryo, waayo, wuxuu arkay in boqorku
belaayo la damacsan yahay. 8 Markaasaa boqorkii beertii ka
soo noqday oo galay meeshii martiqaadka khamriga lagu
dhigay, Haamaanna wuxuu ku sii dhacayay sariirtay Esteer
fuushanayd. Markaasaa boqorkii wuxuu yidhi, Xataa ma
boqoradduu hortayda ku xoogayaa iyadoo guriga joogta?
Oo isla markii eraygaasu boqorka afkiisii ka soo baxay
ayaa Haamaan wejigiisii la deday. 9 Kolkaasaa Xarboona
oo ahaa boqorka midiidinnadiisa midkood oo boqorka
hortiisa joogay ayaa yidhi, Weliba bal eeg, waxaa Haamaan
gurigiisa ag qotoma qoriga deldelaadda oo dhererkiisu
yahay konton dhudhun, oo Haamaan u sameeyey inuu
ku deldelo Mordekay oo boqorka wax wanaagsan kaga
hadlay. Markaasaa boqorkii yidhi, Halkaas ku deldela. 10
Sidaas daraaddeed Haamaan waxaa lagu deldelay meeshii
deldelaadda oo uu u diyaarshay inuu Mordekay ku deldelo,
oo markaasaa boqorkii cadho baxay.

**8** Oo isla maalintaas ayaa Boqor Ahashwerus wuxuu
gurigii Haamaan oo ahaa cadowgii Yuhuudda siiyey
Boqorad Esteer. Mordekayna wuxuu yimid boqorka hortiisii,
waayo, Esteer ayaa boqorka u sheegtay wuxuu iyada
u ahaa. 2 Markaasaa boqorkii wuxuu iska soo bixiyey
kaatunkiisii uu Haamaan ka soo qaatay, oo wuxuu siiyey
Mordekay. Esteerna gurigii Haamaan ayay Mordekay madax
uga dhigtay. 3 Oo Esteer boqorka hortiisii ayay haddana
ka hadashay, oo intay cagihiisa ku dhacday ayay iyadoo
ooyaysa ka bariday inuu baabbi'iyo belaayadii Haamaan kii
reer Agag iyo xeeladdiisii uu Yuhuudda ku samaynayay.
4 Markaasaa boqorkii wuxuu Esteer u soo fidiyey ushii
dahabka ahayd. Oo taas daraaddeed Esteer way kacday
oo waxay istaagtay boqorka hortiisii. 5 Oo kolkaasay tidhi,
Boqorow, haddaad ku faraxsan tahay, oo aad raalli iga
tahay, oo haddii xaalkaasu kula wanaagsan yahay, oo aad
ii bogtay, ha la qoro warqado lagu beddelo warqadihii uu
xeeladda ku qoray Haamaan ina Hamedaata oo ahaa reer
Agag, kuwaasoo uu u qoray in lagu baabbi'iyo Yuhuudda
boqorka gobolladiisa deggan oo dhan. 6 Waayo, bal sidee
baan ugu adkaysan karaa inaan arko belaayada dadkayga
ku dhacaysa? Amase sidee baan ugu adkaysan karaa
inaan arko baabbi'inta dadkayga? 7 Markaasaa Boqor
Ahashwerus wuxuu Boqorad Esteer iyo Yuhuudigii Mordekay
ku yidhi, Bal eega, gurigii Haamaan ayaan Esteer siiyey,
isagiina waxaa lagu deldelay meesha deldelaadda, maxaa
yeelay, wuxuu gacan ku fidiyey Yuhuudda. 8 Haddaba

idinku sidaad doonaysaan Yuhuudda warqado ugu qora.
Magaca boqorka ku qora, oo ku shaabadeeya kaatunka
boqorka, waayo, qorniinkii lagu qoro boqorka magiciisa, oo
haddana kaatunka boqorka lagu shaabadeeyo, ninna ma
beddeli karo. 9 Oo markaasaa isla wakhtigaasba waxaa loo
yeedhay boqorka karraaniyadiisii. Oo waxayna ahayd bisha
Siwaan, oo ah bisha saddexaad, maalinteedii saddex iyo
labaatanaad. Oo waxaa la qoray wax alla wixii Mordekay
uu ku amray Yuhuuddii iyo saraakiishii iyo taliyayaashii iyo
amiirradii joogay gobolladii ku yiil Hindiya iyo Itoobiya inta ka
dhex leh, oo ahaa boqol iyo toddoba iyo labaatan gobol,
oo waxaa gobol kasta loogu qoray fartiisii, dad kastana
waxaa loogu qoray afkoodii, oo Yuhuuddiina waxaa loogu
qoray fartoodii iyo afkoodiiba. 10 Oo wuxuu warqadihii ku
qoray Boqor Ahashwerus magiciisii, oo ku shaabadeeyey
kaatunkii boqorka, markaasuu u sii dhiibay warqaadayaal
fuushan fardo iyo baqlo iyo rakuubbo. 11 Oo boqorkii
wuxuu u oggolaaday Yuhuuddii magaalo kasta degganayd
inay isa soo wada urursadaan oo ay daaficidda naftooda
isu taagaan, oo ay baabbi'iyaan, oo laayaan, oo halaag
ku ridaan kulli xooggii dadka iyo gobolkii doonayay inay
weeraraan iyaga iyo dhallaankooda iyo dumarkoodaba, iyo
inay maalkooda booli ahaan u dhacaan. 12 Oo amarkii
wuxuu ahaa in Boqor Ahashwerus gobolladiisa oo dhan
saas isku maalin laga yeelo, taas oo ah maalinta saddex iyo
tobnaad oo bisha laba iyo tobnaad ee Adaar la yidhaahdo.
13 Oo warqaddii amarku ku qornaa naqilkeedii ayaa lagu
faafiyey gobol kasta, oo waxaa loo sii dhiibay dadyowga
oo dhan, taasoo leh, Maalintaas Yuhuuddu diyaar ha u
ahaadeen inay ka aarsadaan cadaawayaashooda. 14 Oo
sidaas daraaddeed warqaadayaashii fuushanaa baqlo iyo
rakuubbo way ambabbexeen, iyagoo degdegsan oo ku
dhaqsanaya boqorka amarkiisa; oo amarkiina waxaa lagu
naadiyey Shuushan oo ahayd hoygii boqorka. 15 Markaasaa
Mordekay wuxuu ka tegey boqorka hortiisii isagoo qaba
dhar boqortooyo oo ah buluug iyo caddaan, oo madaxana
waxaa u saarnaa taaj weyn oo dahab ah, wuxuuna huwanaa
shulug laga sameeyey maro wanaagsan oo guduudan, oo
magaaladii Shuushanna waa laga qayliyey oo laga farxay. 16
Oo Yuhuuddiina waxaa u ahaaday iftiin iyo farxad iyo rayrayn
iyo sharaf. 17 Oo gobol kasta iyo magaalo kasta oo boqorka
amarkiisii iyo naadadiisii ay gaadheen, Yuhuuddii waxaa u
ahaaday farxad iyo rayrayn, iyo iid iyo maalin wanaagsan.
Oo qaar badan oo ka mid ahaa dadyowgii dalka degganaa
waxay noqdeen Yuhuud, maxaa yeelay, waxaa iyaga ku
dhacday cabsidii ay Yuhuudda ka cabsanayeen.

9 Haddaba bishii laba iyo tobnaad, oo ahayd bisha
Adaar, maalinteedii saddex iyo tobnaad, markii boqorka
amarkiisii iyo naadadiisii ay soo dhowaadeen in la oofiyo,
maalintaas oo ahayd maalintii Yuhuudda cadaawayaashoodii
ay rajaynayeen inay Yuhuudda u taliyaan, laakiin loo beddelay
oo ay noqotay maalintii ay Yuhuuddii u taliyeen kuwii iyaga
nebcaa, 2 ayaa Yuhuuddii iska soo wada urursadeen
magaalooyinkoodii ku yiil gobolladii Boqor Ahashwerus oo
dhan inay gacan u qaadaan kuwii doonayay inay iyaga wax
yeelaan; oo mana jirin nin iyaga hor istaagi karay, maxaa
yeelay, cabsidoodii baa ku dhacday dadyowgii oo dhan.
3 Oo waxaa Yuhuuddii caawiyey amiirradii gobollada oo
dhan, iyo saraakiishii, iyo taliyayaashii, iyo kuwii boqorka
hawshiisii qaban jiray oo dhan, maxaa yeelay, iyagu waxay
ka cabsanayeen Mordekay. 4 Waayo, Mordekay wuxuu
ku weynaa gurigii boqorka, oo warkiisuna wuxuu wada
gaadhay gobollada oo dhan, maxaa yeelay, ninkii Mordekay
ahaa aad iyo aad buu u sii weynaaday. 5 Oo Yuhuuddiina
cadaawayaashoodii oo dhan waxay la dhaceen seef, wayna
laayeen, oo baabbi'iyeen, oo waxay iyagii ku sameeyeen
wixii ay doonayeen inay kuwa iyaga neceb ku sameeyaan.
6 Oo Shuushan oo ahayd hoygii boqorka ayay Yuhuuddu
shan boqol oo nin ku laayeen oo ku baabbi'iyeen. 7 Oo
waxaa kuwaas ka mid ahaa Farshandaataa iyo Dalfoon
iyo Asfaataa, 8 iyo Fooraataa iyo Adaliyaa iyo Ariidaataa,
9 iyo Farmashtaa iyo Ariisay iyo Ariiday iyo Waysaataa,
10 oo dhammaantood ahaa tobankii wiil oo uu dhalay
Haamaan ina Hamedaata oo ahaa Yuhuudda cadowgoodii.
Kuwaasay wada dileen, laakiinse maalkoodii far ma ay
saarin. 11 Oo maalintaas intii lagu laayay Shuushan oo
ahayd hoygii boqorka tiradoodii waxaa la keenay boqorka
hortiisa. 12 Markaasaa boqorkii wuxuu Boqorad Esteer
ku yidhi, Yuhuuddii waxay Shuushan oo ah hoygayga ku
laayeen oo ku baabbi'iyeen shan boqol oo nin, iyo Haamaan
tobankiisii wiil. Oo gobolladayda intooda kale maxay ku
sameeyeen! Haddaba baryadaadu waa maxay, waa lagu
siinayaaye? Amase maxaad kaloo weyddiisanaysaa? Waa
laguu samaynayaaye. 13 Kolkaasaa Esteer waxay tidhi,
Haddii boqorku raalli ku yahay, Yuhuudda Shuushan joogta
ha la siiyo fasax ay berrito ku sameeyaan si waafaqsan
amarkan maanta dhacay, oo Haamaan tobankiisa wiilba ha
lagu deldelo meesha deldelaadda. 14 Markaasaa boqorkii
wuxuu amray in saas la yeelo, oo amar baa Shuushan lagu
naadiyey, oo Haamaan wiilashiisiina waa la deldelay. 15 Oo
haddana Yuhuuddii Shuushan joogtay dhammaantood way
isa soo wada urursadeen bishii Adaar, maalinteedii afar iyo
tobnaad, oo waxay Shuushan ku laayeen saddex boqol oo

nin, laakiinse maalkoodii far ma ay saarin. 16 Oo Yuhuuddii
kale oo joogay boqorka gobolladiisa iyana dhammaantood
way isa soo wada urursadeen, oo ay daaficidda naftooda
isu taageen, oo way ka raysteen cadaawayaashoodii, oo
waxay kuwii iyaga nebcaa ka laayeen shan iyo toddobaatan
kun oo qof, laakiinse maalkoodii far ma ay saarin. 17 Oo
taasuna waxay dhacday bishii Adaar, maalinteedii saddex
iyo tobnaad, oo bishaas maalinteedii afar iyo tobnaadna
way nasteen, oo waxay ka dhigeen maalin iid ah oo farxad
badan. 18 Laakiinse Yuhuuddii Shuushan joogtay way isa
soo wada urursadeen bishaas, maalinteedii saddex iyo
tobnaad, iyo maalinteedii afar iyo tobnaad, oo isla bishaas,
maalinteedii shan iyo tobnaadna way nasteen, oo waxay
ka dhigeen maalin iid ah oo farxad badan. 19 Haddaba
Yuhuuddii tuulooyinka joogtay oo degganayd magaalooyinka
aan derbiga lahayn, bisha Adaar, maalinteeda afar iyo
tobnaad, waxay ka dhigaan maalin farxadeed oo iid ah, oo
maalin wanaagsan ah, iyo maalin waxyaalo wanaagsan mid
ba midka kale u diro. 20 Markaasaa Mordekay waxyaalahaas
oo dhan qoray, oo wuxuu warqado u diray kulli Yuhuuddii
joogtay Boqor Ahashwerus gobolladiisa oo dhan, kuwii
dhowaa iyo kuwii fogaaba, 21 oo wuxuu ku amray iyagii inay
sannad walba bisha Adaar, afar iyo tobankeeda iyo shan
iyo tobankeeda, dhawraan, 22 oo ay ka dhigaan maalmihii
Yuhuuddii ay cadaawayaashoodii ka raysteen iyo bishii
xaggooda ay murugtii farxad u beddelantay, baroortiina
maalin wanaagsan; inay ka dhigaan maalmo iid ah oo farxad
badan, oo mid ba midka kale waxyaalo wanwanaagsan u
diro, oo masaakiintana hadiyado la siiyo. 23 Oo Yuhuuddiina
waxay aqbaleen inay sameeyaan wixii ay bilaabeen, iyo sidii
Mordekay uu iyaga u soo qoray, 24 maxaa yeelay, Haamaan
ina Hamedaata oo ahaa reer Agag, oo Yuhuudda oo dhan
cadowgooda ahaa, xeelad buu ku sameeyey Yuhuudda
inuu iyaga baabbi'iyo, oo wuxuu riday saami Fuur la odhan
jiray, si uu u laayo oo uu u baabbi'iyo. 25 Laakiinse markuu
xaalkaasu boqorka hortiisa yimid, wuxuu amray oo warqado
ku qoray in xeeladdiisii uu Yuhuudda ku sameeyey ay
madaxiisa ku soo noqoto, iyo in isaga iyo wiilashiisiiba
lagu deldelo meesha deldelaadda. 26 Haddaba sidaas
daraaddeed maalmahaas waxay u bixiyeen FUURIIM, oo
waxay ugu yeedheen saamigii magiciisii FUUR la odhan
jiray. Saas aawadeed warqaddan erayadeedii oo dhan, iyo
wixii xaalkan ku saabsanaa oo ay arkeen, iyo wixii iyaga u
yimid, 27 Yuhuuddu waxay amreen oo dul saareen iyaga
iyo farcankooda, iyo in alla intii iyaga ku darmatay, inaanay
ka baaqan, inay labadaas maalmood u dhawraan sannad
kasta sida waafaqsan waxa laga qoray, iyo goor waafaqsan
xilligii la yidhi; 28 iyo in qarni kastaa, iyo qolo kastaa, iyo dal
kastaa, iyo magaalo kastaaba ay maalmahaas xusuustaan
oo dhawraan, iyo in maalmahaas FUURIIM la yidhaahdo
aanay Yuhuuddu ka baaqan, oo aanay xusuustooduna xataa
farcankooda dambe ka baabbi'in. 29 Markaasaa Boqorad
Esteer oo ahayd ina Abiixayil, iyo Yuhuudigii Mordekay ahaa
waxay amar buuxa ku qoreen, si ay u adkeeyaan warqaddan
labaad oo ku saabsan FUURIIM. 30 Oo waxaa warqado
loo diray kulli Yuhuuddii joogtay boqol iyo toddoba iyo
labaatankii gobol oo boqortooyadii Ahashwerus, oo waxaa
loogu dhawaaqay hadal nabaadiino iyo run ah, 31 si loo
adkeeyo maalmahaas FUURIIM la yidhaahdo wakhtigooda,
sidii ay u amreen Yuhuudigii Mordekay iyo Boqorad Esteer,
iyo sidii ay iyagu nafsaddooda iyo farcankooda ugu amreen
xaalkii soonka iyo qayladoodii. 32 Oo Esteer amarkeediina
wuxuu sii adkeeyey xaalkan ku saabsan FUURIIM; oo buug
baa lagu qoray.

10 Markaasaa Boqor Ahashwerus wuxuu baad saaray
dhulkii iyo gasiiradihii baddaba. 2 Oo falimihii uu
xooggiisii iyo itaalkiisii ku sameeyey oo dhan, iyo warkii
Mordekay weynaantiisii uu boqorku isaga u sara mariyey
sow kuma wada qornayn buuggii taariikhda oo boqorradii
Maaday iyo Faaris? 3 Haddaba Yuhuudigii Mordekay ahaa
wuxuu ahaa ninkii ku xigay Boqor Ahashwerus, oo xagga
Yuhuuddana wuxuu ahaa nin weyn, oo walaalihiisa badanuna
way aqbaleen; oo wuxuuna ahaa nin doondoonaa wanaagga
dadkiisa oo nabaadiino kula hadla farcankiisa oo dhan.

# Ayuub

**1** Dalka Cuus la yidhaahdo waxaa joogi jiray nin magiciisa
Ayuub la odhan jiray, oo ninkaasuna wuxuu ahaa nin
qumman oo toosan, wuxuuna ahaa mid Ilaah ka cabsada oo
sharka ka fogaada. **2** Oo waxaa isaga u dhashay toddoba
wiil iyo saddex gabdhood. **3** Oo weliba xoolihiisuna waxay
ahaayeen toddoba kun oo ido ah, iyo saddex kun oo geel
ah, iyo shan boqol oo dibi oo laba laba ah, iyo shan boqol
oo dameerood oo dhaddig ah, oo weliba wuxuu kaloo lahaa
addoommo aad u badan, oo sidaas daraaddeed ninkaasu
wuxuu ahaa kan ugu wada weyn dadka bariga oo dhan. **4** Oo
wiilashiisii way tegi jireen, oo midkood kastaaba maalintiisa
ayuu gurigiisa diyaafad ku samayn jiray, oo waxay u cid
direen oo u yeedheen saddexdii gabdhood oo walaalahood
ahaa inay wax la cunaan oo wax la cabbaan aawadeed. **5** Oo
maalmihii ay diyaafaddii hayn jireen markay dhammaadaan
ayaa Ayuub carruurtiisii u cid diri jiray oo daahirin jiray,
oo intuu aroor hore kaco ayuu intay ahaayeen oo dhan
u bixin jiray qurbaanno la gubo, waayo, Ayuub wuxuu
isyidhi, Waaba intaasoo wiilashaydu ay dembaabeen, oo
ay qalbigooda Ilaah wax xun kaga sheegeen. Oo Ayuubna
sidaasuu yeeli jiray had iyo goorba. **6** Haddaba waxaa
jirtay maalin ay Ilaah wiilashiisu u yimaadeen inay Rabbiga
hortiisa isa soo taagaan, oo weliba Shayddaanna wuu soo
dhex galay. **7** Markaasaa Rabbigu wuxuu Shayddaan ku
yidhi, War xaggee baad ka timid? Oo Shayddaan wuxuu
Rabbiga ugu jawaabay, Waxaan ka imid dhulkii aan maray,
oo aan hor iyo dibba ugu dhex socday. **8** Markaasaa
Rabbigu wuxuu Shayddaan ku yidhi, Addoonkayga Ayuub
ma ka fikirtay? Maxaa yeelay, isaga oo kale dhulka ma
joogo, waayo, isagu waa nin qumman oo toosan, oo ah
mid Ilaah ka cabsada oo sharka ka fogaada. **9** Markaasaa
Shayddaan Rabbiga u jawaabay oo wuxuu ku yidhi, Bal
Ayuub ma waxtarla'aan buu Ilaah uga cabsadaa? **10** Sow
deyr kuma aad wareejin isaga, iyo reerkiisa, iyo waxa uu
haysto oo dhanba? Shuqulkii gacmihiisaad barakaysay,
oo xoolihiisiina dhulkay aad ugu bateen. **11** Laakiinse
haddaba bal gacantaada soo fidi, oo wuxuu haysto oo
dhan taabo, oo isna sida runta ah, hortaada wax xun buu
kaaga sheegi doonaa. **12** Markaaasaa Rabbigu wuxuu
Shayddaan ku yidhi, Bal eeg, wuxuu haysto oo dhammu
gacantaaday ku jiraan, laakiinse isaga nafsaddiisa waa
inaadan far saarin. Markaasaa Shayddaan Rabbiga hortiisii
ka tegey. **13** Oo maalin ay wiilashiisii iyo gabdhihiisii wax ku
cunayeen oo khamri ku cabbayeen gurigii walaalkoodii ugu
weynaa ayaa **14** waxaa Ayuub u yimid mid wargeeye ah
oo wuxuu ku yidhi, Iyadoo dibidii ay beerta jeexayaan oo
dameerihiina ay agtooda daaqayaan **15** ayaa waxaa na soo
weeraray reer Shebaa, oo waxay dheceen xoolihii, oo weliba
midiidinnadiina seef bay ku laayeen, oo anigoo keliya ayaa
ka soo baxsaday inaan warka kuu soo sheego. **16** Oo weli
intii kaasu sii hadlayay ayuu mid kale yimid, oo wuxuu yidhi,
Ilaah dabkiisii ayaa samada ka soo dhacay, oo wuxuu wada
gubay oo baabbi'iyey idihii iyo midiidinnadii la jirayba, oo
anigoo keliya ayaa ka soo baxsaday inaan warka kuu soo
sheego. **17** Oo weli intii kaasu sii hadlayay ayuu mid kale
yimid, oo wuxuu yidhi, Reer Kaldayiin oo saddex koox ah
ayaa geelii soo weeraray, oo dhammaantiisna way dheceen,
oo weliba midiidinnadiina seef bay ku laayeen, oo anigoo
keliya ayaa ka soo baxsaday inaan warka kuu soo sheego.
**18** Oo weli intii kaasu sii hadlayay ayuu mid kale yimid, oo
wuxuu yidhi, Wiilashaadii iyo gabdhahaagii waxay wax ku
cunayeen oo khamri ku cabbayeen gurigii walaalkooda ugu
weyn, **19** oo bal eeg, waxaa cidlada ka timid dabayl weyn,
oo gurigii afartiisa rukun bay ku dhufatay, kolkaasuu ku
dumay raggii dhallinyarada ahaa, oo dhammaantood way
dhinteen, oo anigoo keliya ayaa ka soo baxsaday inaan
warka kuu soo sheego. **20** Markaasaa Ayuub sara joogsaday,
oo huwiskiisii jeexjeexay, oo madaxiisiina wuu xiiray, oo intuu
dhulka ku dhacay ayuu sujuuday, **21** oo wuxuu yidhi, Anigoo
qaawan baan uurkii hooyaday ka soo baxay, oo haddana
anigoo qaawan baan halkaas ku noqon doonaa. Rabbigaa
wax i siiyey, oo haddana Rabbigaa iga qaatay, ammaan
waxaa leh magaca Rabbiga. **22** Oo waxyaalahaas oo dhan
Ayuub innaba kuma uu dembaabin, oo Ilaahna eed kama uu
sheegin.

**2** Haddaba waxaa kaloo jirtay maalin kale oo ay Ilaah
wiilashiisu u yimaadeen inay Rabbiga hortiisa isa soo
taagaan, oo weliba Shayddaanna wuu soo dhex galay, si
uu isna Rabbiga isu soo hor taago. **2** Markaasaa Rabbigu
wuxuu Shayddaan ku yidhi, War xaggee baad ka timid?
Oo Shayddaan wuxuu Rabbiga ugu jawaabay, Waxaan ka
imid dhulkii aan maray, oo aan hor iyo dibba ugu dhex
socday. **3** Markaasaa Rabbigu wuxuu Shayddaan ku yidhi,
Addoonkayga Ayuub ma ka fikirtay? Maxaa yeelay, isaga oo
kale dhulka ma joogo, waayo, isagu waa nin qumman oo
toosan, oo ah mid Ilaah ka cabsada oo sharka ka fogaada. Oo
weliba isagu daacadnimadiisii wuu sii haystaa, in kastoo aad
igu dirtay, si aan isaga sababla'aan ugu halligo. **4** Markaasaa
Shayddaan wuxuu Rabbiga ugu jawaabay, Haragba harag
baa loo baxshaa, oo nin wuxuu haysto oo dhan ayuu naftiisa
u baxshaa. **5** Laakiinse bal haatan gacantaada soo fidi, oo

lafihiisa iyo jiidhkiisa taabo, oo isna markaasuu hortaada
wax xun kaaga sheegi doonaa. 6 Markaasaa Rabbigu
wuxuu Shayddaan ku yidhi, Bal eeg, gacantaaduu ku jiraa,
waxaadse u daysaa naftiisa. 7 Markaasaa Shayddaan
Rabbiga hortiisii ka tegey, oo wuxuu Ayuub tin iyo cedhib ku
dhuftay boogo xunxun. 8 Markaasaa Ayuub wuxuu qaatay
dheri burburkiis inuu isku xoqo, oo wuxuu dhex fadhiistay
dambas. 9 Markaasaa naagtiisii waxay ku tidhi, War ma weli
baad daacadnimadaadii sii haysanaysaa? War hoy, Ilaah
wax xun ka sheeg, oo iska dhimo. 10 Laakiinse wuxuu iyadii
ku yidhi, Waxaad u hadlaysaa sida naagaha nacasyada
ah middood. Naa waa sidee? Ilaah gacantiisa intaynu
samaan ka qaadanno, miyaynan xumaanna ka qaadanayn?
Oo in kastoo waxyaalahaas oo dhammu ay ku dheceen
Ayuub innaba afkiisa kuma dembaabin. 11 Haddaba Ayuub
saddexdiisii saaxiib markay maqleen xumaantii isaga ku
dhacday oo dhan ayuu midkood kastaaba meeshiisii ka
yimid. Oo kuwaasu waxay ahaayeen Eliifas oo ahaa reer
Teemaan, iyo Bildad oo ahaa reer Shuuxii, iyo Soofar oo
ahaa reer Nacamaatii, oo iyana waxay dhammaantood ballan
ku dhigteen inay u yimaadaan si ay isaga ugu tacsiyeeyaan
oo ay u qalbi qaboojiyaan. 12 Oo markay isagii meel fog ka
arkeen oo ay aqoon waayeen ayay codkoodii kor u qaadeen
oo ooyeen, oo midkood waluba wuxuu jeexjeexay huwiskiisii,
oo intay boodh xagga samada u tuureen ayay madaxa isaga
shubeen. 13 Oo toddoba maalmood iyo toddoba habeen
ayay isagii dhulka la fadhiyeen, oo midkoodna eray keliya
kuma odhan, waayo, waxay arkeen inuu aad iyo aad u
xanuunsanayo.

**3** Markaas dabadeed Ayuub intuu afkiisa furay ayuu
habaaray maalintii uu dhashay. 2 Oo Ayuub intuu hadal
bilaabay ayuu yidhi: 3 Dharaartii aan dhashay ha baabba'do
Iyo habeenkii la yidhi, Wiil baa calool galay. 4 Maalintaasu
gudcur ha ahaato; Oo Ilaah yuusan iyada xagga sare
kaga fiirsan, Oo nuurkuna yuusan iftiimin. 5 Gudcur iyo
hooska dhimashadu iyada mulki ha ka dhigteen. Daruuru
ha ku degto, Oo wixii maalin madoobeeya oo dhammu ha
cabsiiyeen. 6 Oo habeenkaasna gudcur weynu ha qabsado,
Oo ayaamaha sannadda yuusan ka dhex rayrayn. Oo yuusan
soo dhex gelin bilaha tiradooda. 7 Bal eeg, habeenkaasu
cidla ha noqdo; Oo cod faraxsan yaanu ka dhex yeedhin.
8 Oo isaga ha habaareen kuwa maalinta habaaraa, Oo
kicin kara bahalka la yidhaahdo Lewiiyaataan. 9 Fiidka
xiddigihiisu gudcur ha noqdeen, Iftiin ha doondoono oo
yuusan helin; Oo innaba yuusan arkin kaaha waaberiga. 10
Maxaa yeelay, isagu ma uu awdin irdihii maxalka hooyaday,
Oo indhahaygana dhib kama uu qarin. 11 Bal maxaan u
dhiman waayay markaan uurka ka soo baxay? Oo maxaa
naftu iiga bixi weyday isla markaan caloosha ka soo baxay?
12 Bal jilbuhu maxay ii aqbaleen? Amase naasuhu inaan
nuugo? 13 Waayo, hadda xasilloonaan baan ku jiifi lahaa;
Oo waan iska seexan lahaa, oo waan nasan lahaa, 14 Aniga
iyo boqorrada iyo lataliyayaasha dunida Oo nafsaddooda
taallooyin u dhistay, 15 Iyo amiirradii dahabka lahaan
jiray, Oo guryahooda lacagta ka buuxsaday; 16 Bal dhicis
qarsoon maxaan u ahaan waayay? Ama sida dhallaan
aan innaba iftiinka arag? 17 Halkaas kuwa sharka ahu
cidna kuma sii dhibaan, Oo kuwa daallanuna halkaasay
ku nastaan. 18 Maxaabiistuna halkaasay dhammaantood
ku wada istareexaan, Mana ay maqlaan kii dulmi jiray
codkiisa. 19 Yar iyo weynba halkaasaa la wada joogaa,
Oo addoonkuna sayidkiisa waa ka xor. 20 Bal iftiin maxaa
loo siiyaa kan dhibaataysan? Maxaase loo nooleeyaa kan
naftiisu la qadhaadhaatay, 21 Oo dhimasho u xiisooda, oo
ayan u imanayn, Oo daraaddeed dhulka u qodqoda intuu
khasnado qarsoon qodi lahaa in ka sii badan, 22 Kuwaasoo
aad u reyreeya, Oo farxa hadday qabriga heli karaan? 23
Bal maxaa iftiin loo siiyaa nin jidkiisu qarsoon yahay, Oo
Ilaah deyr ku wareejiyey? 24 Waayo, intaanan wax cunin
ayaan taahaa, Oo cabaadkayguna wuxuu u shubmaa sida
biyo oo kale. 25 Waayo, hadba wixii aan ka cabsado ayaa
igu soo dega, Oo wixii aan ka baqo ayaa ii yimaada. 26 Ma
aan istareexsani, mana aan xasillooni, mana aan nasto;
Laakiinse hadba dhibaato baa ii timaada.

**4** Markaasaa Eliifas kii reer Teemaan u jawaabay, oo
wuxuu ku yidhi, 2 Mid hadduu isku dayo inuu kula hadlo,
ma ka xumaanaysaa? Laakiinse bal yaa hadal iska celin
kara? 3 Bal eeg, adigu kuwa badan wax baad bartay, Oo
gacmihii itaalka darnaana waad xoogaysay. 4 Erayadaadu
way tiiriyeen kii sii dhacayay, Oo jilbihii tabarta yaraana
waad adkaysay. 5 Laakiinse haatan dhibaatadu aday kuu
timid, oo waad taag yaraanaysaa, Wayna ku soo gaadhay,
oo waad dhibaataysan tahay. 6 War kalsoonidaadu sow ma
aha cabsida aad Ilaahaaga ka cabsato, Rajadaaduse sow
ma aha daacadnimada jidadkaaga? 7 Waan ku baryayaaye
bal wax xusuuso, bal yaa weligiis halligmay isagoo aan xaq
qabin? Amase xaggee baa mid qumman lagu halaagay? 8
Sidaan anigu arkay, weligoodba kuwii xumaan tacbadaa, Oo
belaayo beertaa, isla waxaasay goostaan. 9 Iyagu waxay ku
baabba'aan Ilaah neeftiisa, Oo waxay ku dhammaadaan
afuufidda cadhadiisa. 10 Libaaxa cidiisii, iyo aarka cadhaysan
codkiisii, Iyo libaaxyada yaryar miciyahoodiiba waa jajabaan.
11 Libaaxa duqa ahu ugaadhla'aanta buu u bakhtiyaa, Oo

goosha dhasheediina way kala firdhaan. 12 Haddaba war
baa qarsoodi la iigu keenay, Oo dhegtayduna faqiisay
qabsatay. 13 Habeenkii markay riyooyinku fikirro kiciyaan,
Oo ay dadku hurdo weyn ku fogaadaan, 14 Ayaa cabsi
iyo gariiru igu dhacay, Oo lafahayga oo dhammuna way
wada ruxruxmadeen. 15 Markaasaa ruux wejigayga soo hor
maray, Oo timihii jidhkayguna waa soo wada istaageen. 16
Oo isagii wuu joogsaday, laakiinse muuqashadiisii waan kala
saari waayay; Muuqaal baa indhahayga hortooda joogay;
Intii mudda ah aamusnaan baa jirtay, dabadeedna waxaan
maqlay cod leh, 17 War nin dhiman karaa miyuu Ilaah ka sii
caaddilsanaan karaa? Mase nin baa ka sii daahirsanaan kara
kii isaga abuuray? 18 Bal eeg, isagu addoommadiisa iskuma
halleeyo; Oo malaa'igihiisana nacasnimuu ku eedeeyaa. 19
Intee ka sii badan buu eedeeyaa kuwa guryaha dhoobada
ah deggan, Oo aasaaskoodii boodhka ku jiro, Oo sida
balanbaallis u burbura! 20 Subaxdii iyo fiidkii inta ka dhex
leh ayay baabba'aan; Weligoodba way halligmaan iyadoo
aan ciduna ka fikirayn. 21 Xadhkaha teendhooyinkoodii sow
lama siibo? Way dhintaan iyagoo aan xigmad lahayn.

5 Hadda bal u yeedh, mid kuu jawaabayaa ma jiraa? Balse
kuwa quduuska ah midkoodee baad u jeesanaysaa? 2
Waayo, ninkii nacas ah xanaaqiisaa dila, Oo kii doqon ahna
ciilkiisaa dila. 3 Anba waxaan arkay nacas xidid yeeshay.
Laakiinse degdeg baan u habaaray rugtiisii. 4 Carruurtiisu
nabaadiino way ka fog yihiin, Oo iridda agteeda ayaa iyaga
lagu burburiyaa, Mana jiro mid samatabbixiyaa. 5 Kuwaas
beertay goostaan waxaa cuna kuwa gaajaysan, Oo xataa
qodxanta way kala soo dhex bixiyaan, Oo maalkoodana
waxaa afka u kala haya siriq. 6 Waayo, belaayo kama soo
baxdo ciidda, Dhibaatona kama soo dhex booddo dhulka,
7 Laakiinse binu-aadmigu dhibaato buu u dhashay, Sida
dhimbiiluhu kor ugu duulaan. 8 Aniguse Ilaah baan baryi
lahaa, Oo xaalkaygana Ilaah baan u dhiibi lahaa, 9 Kaasoo
sameeya waxyaalo waaweyn oo aan la baadhi karin, Iyo
waxyaalo yaab badan oo aan la tirin karin, 10 Oo dhulka roob
ku di'iya, Beerahana biyo u soo dira. 11 Oo kuwa hooseeyana
kor buu u qaadaa, Kuwa baroortana nabaadiinuu ku
sarraysiiyaa. 12 Madhnaan buu ka dhigaa talada khaa'innada,
Si ayan gacmahoodu u oofin karin farsamadoodii. 13 Isagu
kuwa xigmadda leh ayuu khiyaanadooda ku qabtaa; Oo
kuwa qalloocan taladoodana degdeg baa loo rogaa. 14 Oo
maalinnimada ayay gudcur helaan, Oo hadhka ayay wax
haabhaabtaan sida habeennimada oo kale. 15 Laakiinse
isagu kuwa baahan ayuu ka badbaadiyaa seefta afkooda,
Iyo kuwa xoogga badan gacantooda. 16 Sidaas daraaddeed
kii miskiin ahu rajuu leeyahay, Xumaantuse afkeeday xidhaa.
17 Bal eeg, waxaa faraxsan ninkii Ilaah canaanto, Haddaba
ha quudhsan Qaadirka edbintiisa. 18 Waayo, isagu wax
buu nabar u yeelaa, waana duubaa; Wuu dhaawacaa,
gacmihiisuna way bogsiiyaan. 19 Wuxuu kaa samatabbixin
doonaa lix dhibaato, Oo marka toddobaadna belaayo kuma
taaban doonto innaba. 20 Wakhtiga abaarta ah dhimashuu
kaa furan doonaa, Wakhtiga dagaalkana xoogga seefta. 21
Waad ka qarsoonaan doontaa karbaashidda carrabka; Oo
baabbi'iddu markay timaadana kama aad cabsan doontid
innaba. 22 Waad ku qosli doontaa baabbi'idda iyo abaarta,
Oo dugaagga dhulkana kama aad baqi doontid. 23 Waayo,
axdi baad la yeelan doontaa dhagaxyada berrinka, Oo
dugaagga duurkana heshiis baad la ahaan doontaa. 24 Oo
waxaad ogaan doontaa in teendhadaadu nabdoon tahay,
Oo xeradaada waad soo booqon doontaa, oo waxba kama
waayi doontid innaba. 25 Oo weliba waxaad ogaan doontaa
in farcankaagu badnaan doono, Oo dhashaaduna sida
cawska dhulka bay ahaan doontaa. 26 Oo cimri dheer baad
qabrigaaga ku geli doontaa, Sida xidhmo hadhuudh ah
xilliga loo soo xidho. 27 Bal eeg, annagu xaalkan waannu
baadhnay, oo sidaas bayna tahay, Haddaba bal maqal, oo
nafsaddaada u ogow.

6 Markaasaa Ayuub jawaabay oo wuxuu yidhi, 2 Hahe
haddii dhibkayga la miisaami lahaa, Oo masiibadayda
kafado la wada saari lahaa! 3 Wuu ka sii cuslaan lahaa
cammuudda badaha, Sidaas daraaddeed hadalkaygii degdeg
buu noqday. 4 Waayo, Ilaaha Qaadirka ah fallaadhihiisii
ayaa igu dhex jira, Oo naftayduna waabaydoodii way
cabbaysaa, Oo Ilaah cabsiintiisiina anigay igu soo kacdaa.
5 Dameerdibadeedku miyuu ciyaa markuu caws haysto?
Dibiguse miyuu ciyaa markii cunto la siiyo? 6 Wixii aan
dhadhan lahayn miyaa cusbola'aan la cuni karaa? Ukunta
xabkeeduse miyuu dhadhan leeyahay? 7 Naftaydu way
diidaa inay taabato, Waxay ii yihiin sida cunto la naco oo
kale. 8 Hahe bal maan helo waxa aan u baryootamo, Oo
Ilaah bal muu i siiyo waxa aan u xiisoodo! 9 Oo xataa
Ilaah bal muu iska jeclaado inuu i burburiyo, Oo bal muu
gacantiisa iga sii daayo oo i baabbi'iyo! 10 Markaas waan
istareexi lahaaye, Oo waxaan u adkaysan lahaa xanuun
aan ii tudhayn, Waayo, ma aanan diidin Kan Quduuska
ah erayadiisii. 11 Bal xooggaygu waa maxay inaan sugo
aawadeed? Aakhirkayguse waa maxay inaan dulqaato
aawadeed? 12 War xooggaygu ma xoogga dhagaxyada baa?
Mise jidhkaygu ma naxaas baa? 13 War sow ma aha inaanan
iscaawiyi karayn? Sowse xigmaddu igama fogaan? 14 Kii
diyaar u ah inuu qalbi jabo waa in saaxiibkiis u naxariisto

Waaba intaasoo uu ka tago cabsida Ilaaha Qaadirka ahe.
15 Walaalahay waa u khiyaano badnaayeen sida durdur
oo kale, Sida biyaha durdurrada ee iska baabba'a, 16
Kuwaasoo barafka la madoobaaday, Oo uu barafka cad isku
qariyo. 17 Markay qorraxoodaan way libdhaan, Oo markay
kululaadaanna meeshooday ka baabba'aan. 18 Kuwa safraa
gees bay uga leexdaan, Waxay u baxaan xagga cidlada
oo halkaasay ku dhintaan. 19 Waxaa fiiriyey kuwa Teemaa
ka safray, Oo socotooyinkii Shebaa ayaa fishay. 20 Way
ceeboobeen, waayo, way rajeeyeen, Halkaasay yimaadeen,
oo way hungoobeen. 21 Waayo, hadda idinku sidaasaad ii
noqoteen, Waxaad aragteen belaayo, waanad baqdeen. 22
Bal anigu miyaan idhi, Wax i sii? Amase, Maalkaaga hadiyad
iiga keen? 23 Amase, Cadowga gacantiisa iga samatabbixi?
Amase, Iga furo gacanta kan i dulma? 24 Bal wax i bar,
oo anna waan iska aamusayaa; Oo i garansii wixii aan
ku qaldamay. 25 Erayo runu xoog badanaa! Laakiinse bal
canaantiinna muranka ahu maxay caddaysaa? 26 Ma waxaad
u malaynaysaan inaad erayo canaanataan? Maxaa yeelay,
kii quustay hadalkiisu waa sida dabayl oo kale. 27 Waxaad
saami u ridan lahaydeen maalka agoonta, Oo saaxiibkiinna
waad ka faa'iidaysan lahaydeen. 28 Haddaba raalli ahaada
oo bal i fiiriya, Waayo, sida runta ah been idiin sheegi
maayo. 29 Haddaba waan idin baryayaaye iska noqda,
yaan caddaaladla'aanu dhicin, Ee mar kale iska noqda,
waayo, xaalkaygu waa xaq. 30 War ma caddaaladla'aan
baa carrabkayga saaran? Mase carrabkaygaan waxyaalo
xunxun dhadhamin karin?

**7** War sow hawl diyaar uma aha binu-aadmiga dhulka
jooga? Sowse maalmihiisu ma aha sida kuwa shaqaale
oo kale? 2 Sida addoon hoos u xiisooda, Iyo sida shaqaale
mushahaaradiisa filanaya, 3 Sidaasoo kale waxaa lay siiyaa
bilo aan waxtar lahayn, Oo waxaa lay siiyaa habeenno daal
badan. 4 Haddaba markaan jiifsado waxaan idhaahdaa,
Bal goormaan kici doonaa? Laakiinse habeenku waa dheer
yahay Oo tan iyo waaberiga waan rogrogmadaa. 5 Jidhkaygii
waxaa ku dedan dirxiyo iyo qolfo ciid ah, Haddaba dubkaygu
waa isqabsadaa dabadeedna wuu sii dillaacaa. 6 Cimrigaygu
waa ka dheereeyaa dungudbiyaha dharsameeyaha, Oo
rajola'aan baan ku noolahay. 7 Bal xusuusta in noloshaydu
tahay dabayl uun, Ishayduna mar dambe samaan ma arki
doonto. 8 Kii i fiiriya ishiisu mar dambe ima arki doonto,
Indhahaagu way i fiirin doonaan, laakiinse anigu ma jiri doono.
9 Sida daruurtu ay u libidho oo ay u baabba'do, Sidaasoo
kale ayaa kii She'ool hoos u galaa uusan mar dambe kor uga
soo noqonayn. **(Sheol h7585)** 10 Isagu mar dambe gurigiisii
kuma soo noqon doono, Oo meeshiisiina mar dambe ma ay
aqoon doonto. 11 Sidaas daraaddeed anigu afkayga celin
maayo; Waxaan ku hadli doonaa cidhiidhiga qalbigayga,
Oo waxaan ku caban doonaa tiiraanyada qadhaadh oo
naftayda. 12 War anigu ma bad baan ahay, mase nibiriga
badda, Bal maxaad ii daawanaysaa? 13 Markaan idhaahdo,
Sariirtaydaa ii raxayn doonta, Oo gogoshaydaa cabatinkayga
iga sahali doonta, 14 Ayaad riyooyin igu bajisaa, Oo
waxaad igu cabsiisaa muuqashooyin. 15 Sidaas daraaddeed
naftaydu waxay lafahayga ka doorataa Ceejin iyo geeri.
16 Noloshayda waan nacsanahay, oo dooni maayo inaan
weligay sii noolaado; War iska kay daa, waayo, cimrigaygu
waa neefsasho oo kale. 17 Bal binu-aadmigu muxuu yahay
oo aad u weynaynaysaa, Balse maxaad uga fikiraysaa
isaga? 18 Bal maxaad subax kasta u soo booqanaysaa, Oo
aad daqiiqad kasta u tijaabinaysaa? 19 Bal ilaa goormaadan
iga sii jeesanayn, Oo aadan iska kay daynayn intaan
candhuuftayda liqayo? 20 Oo haddii aan dembaabay bal
maxaan kuu sameeyaa Kaaga dadka ilaaliyow? Bal maxaad
iiga dhigatay calaamad, Si aan nafsaddayda culaab ugu
noqdo? 21 Oo bal maxaad xadgudubkayga iiga saamaxi
weyday? Oo dembigaygana maxaad iiga fogayn weyday?
Waayo, haatan ciiddaan ku dhex jiifsan doonaa, Aad baadna
ii doondooni doontaa, laakiinse siima aan jiri doono.

**8** Markaasaa Bildad oo ahaa reer Shuuxii u jawaabay,
oo wuxuu ku yidhi, 2 Ilaa goormaad waxyaalahan ku
hadlaysaa? Oo ilaa goormaa erayada afkaagu ahaanayaan
sida dabayl xoog badan? 3 War ma Ilaah baa garsooridda
qalloociya? Mase Ilaaha Qaadirka ah baa caddaaladda
qalloociya? 4 Haddii carruurtaadii ay isaga ku dembaabeen,
Wuxuu iyagii u gacangeliyey xadgudubkoodii. 5 Haddaad aad
u barido Ilaah, Oo aad baryootankaaga hor dhigto Qaadirka,
6 Haddaad daahir ahaan lahayd oo aad qummanaan lahayd,
Sida xaqiiqada ah haatan wuu kuu toosi lahaa, Oo hoyga
xaqnimadaadana wuu barwaaqayn lahaa. 7 Oo in kastoo
bilowgaagii yaraa, Haddana ugudambaystaadu aad bay
u weynaan lahayd. 8 Waan ku baryayaaye bal qarniyadii
hore wax weyddii, Oo bal soo garwaaqso waxyaalihii ay
awowayaashood fatasheen, 9 (Waayo, innagu waxaynu
nahay qoonkii shalayto oo qudha, oo waxba garan mayno,
Maxaa yeelay, cimrigeenna aan dhulka joognaa waa sida
hoos oo kale.) 10 War sow iyagu wax kuma bari doonaan,
oo wax kuuma sheegi doonaan, Oo sow qalbigooda
kaalama hadli doonaan? 11 War miyaa cawdu ka bixi
kartaa meel aan dhoobo lahayn? Cawsduurkuse miyuu
bixi karaa biyola'aantood? 12 Intuu weli cagaarka yahay
oo aan la gooyn, Wuu ka hor engegaa dhalatada kale oo
dhan. 13 Kuwa Ilaah illooba oo dhan wadiiqooyinkoodu

waa sidaas oo kale, Oo ninkii cibaadalaawe ah rajadiisuna
way baabba'daa. 14 Oo kaas kalsoonaantiisu way kala
jajabtaa, Oo aaminaaddiisuna waa sida xuubcaaro oo kale.
15 Wuxuu ku tiirsan doonaa gurigiisa, laakiinse gurigiisu ma
taagnaan doono. Aad buu u xajin doonaa, laakiinse siima uu
adkaan doono innaba. 16 Isagu waa ku cagaar qorraxda,
Oo laamihiisa curdanka ahuna waxay ka soo kor baxaan
beertiisa. 17 Oo xididdadiisuna waxay isku duuduubaan
taallo dhagaxyo ah, Oo wuxuu fiiriyaa meesha dhagaxyada.
18 Isaga haddii meeshiisa laga baabbi'iyo, Markaasay inkiri
doontaa isaga, oo waxay odhan doontaa, Anigu kumaba
arag. 19 Farxadda jidkiisu waa sidaas, Oo waxaa dhulka ka
soo bixi doona kuwa kaleto. 20 Ilaah marnaba xoori maayo
nin qumman, Kuwa sharka falase tiirin maayo. 21 Wuxuu
afkaaga ka buuxin doonaa qosol, Bushimahaagana qaylo
farxad leh, 22 Kuwa ku neceb waxay xidhan doonaan ceeb,
Teendhada sharrowyaduna mar dambe siima jiri doonto.

9 Markaasaa Ayuub u jawaabay oo wuxuu ku yidhi, 2 Sida
runta ah waan ogahay inay sidaas tahay, Laakiinse sidee
baa nin xaq ugu noqon karaa Ilaah hortiisa? 3 Oo hadduu
doonayo inuu la doodo isaga, Kunkii erayba mid qudha
ugama jawaabi karo. 4 Qalbigiisu waa xigmad miidhan,
oo xooggiisuna waa badan yahay; Bal yaa intuu isaga
ka qalafsanaaday barwaaqoobay? 5 Isagu wuxuu rujiyaa
buuraha, oo iyana ma ay yaqaaniin, Markuu cadhadiisa
ku afgembiyo. 6 Dhulka wuu ka ruxruxaa meeshiisa, Oo
tiirarkiisuna way wada gariiraan. 7 Wuxuu amraa qorraxda,
oo iyana sooma ay baxdo, Xiddigahana wuu xidhaa. 8 Isagoo
keliya ayaa samooyinka kala bixiya, Oo wuxuu ku dul socdaa
hirarka badda. 9 Oo wuxuu sameeyey ururrada xiddigaha
oo la yidhaahdo Orsada iyo Oriyon iyo Toddobaadyada,
Iyo xiddigaha koonfureed. 10 Wuxuu sameeyaa waxyaalo
waaweyn oo aan la baadhi karin, Oo ah waxyaalo yaab
badan oo aan la tirin karin. 11 Wuu i ag maraa, aniguse uma
jeedo isaga, Oo wuu iga gudbaa, aniguse waxba kama ogi.
12 Bal wax buu qabsadaa ee, yaa ka hor joogsan kara? Oo
bal yaa ku odhan doona, War maxaad samaynaysaa? 13
Ilaah cadhadiisa ka soo celin maayo; Oo kalmeeyayaasha
kibirka lahuna isagay hoos foorooften. 14 Haddaba bal anigu
sidee baan ugu jawaabi karaa, Oo aan erayadayda kala
doortaa si aan isaga kula hadlo? 15 In kastoo aan xaq
ahaan lahaa, weliba uma aanan jawaabeen isaga, Illowse
waxaan iska baryi lahaa Kan i xukumaya. 16 Haddaan
baryi lahaa oo uu ii jawaabi lahaa, Ma aanan rumaysteen
xataa inuu codkayga maqlay. 17 Waayo, isagu wuxuu
igu jejebiyaa duufaan, Oo nabrahaygana sababla'aan buu
u sii kordhiyaa. 18 Isagu iima oggola inaan neefsado,
Laakiinse qadhaadh buu iga buuxiyaa. 19 Bal haddaan
xagga xoogga ka hadalno isagu waa itaal miidhan, Balse
xagga xukunka yaa wakhti ii sheegaya? 20 In kastoo aan
xaq ahay, afkayga ayaa i xukumi doona, In kastoo aan
qummanahay, waxaa igu caddaan doonta qalloocnaan. 21
Anigu waan qummanahay, oo nafsaddayda kama fikiro,
Noloshaydana waan quudhsadaa. 22 Kulli waa isku mid, oo
sidaas daraaddeed waxaan idhaahdaa, Isagu wuu wada
baabbi'iyaa kan qumman iyo kan sharka ahba. 23 Haddii
belaayadu haddiiba wax disho, Wuu ku majaajiloon doonaa
jirrabaadda kuwa aan xaqa qabin. 24 Dhulka waxaa gacanta
loo geliyey kan sharka ah; Oo isna wuxuu indhasaabaa
xaakinnadii dhulka. Bal hadduusan isaga ahayn, haddaba
waa ayo? 25 Haddaba cimrigaygu waa ka sii dheereeyaa
nin orda, Wuu iga cararaa, oo wanaagna ma arko. 26
Wuxuu ii dhaafay sida doonniyaha dheereeya, Iyo sida
gorgor raq ku soo deganaya. 27 Haddaan odhan lahaa,
Cabatinkayga waan illoobi doonaa, Oo tiiraanyada jaaha
iga saaran waan iska tuuri doonaa, oo waan faraxsanaan
doonaa, 28 Waxaan ka baqayaa caloolxumadayda oo dhan,
Waayo, waan ogahay inaadan ii haysanayn sidii mid aan
xaq qabin. 29 Kolleyba waa lay xukumayaaye, Bal maxaan
waxtarla'aan u hawshoodaa? 30 Haddaan biyo baraf ah
ku maydho, Oo aan gacmahayga aad iyo aad u nadiifiyo,
31 Adigu waxaad igu dhex tuuri doontaa bohol, Oo xataa
dharkaygu waa i nici doonaa. 32 Waayo, isagu nin ma
aha, sidaydoo kale, si aan isaga ugu jawaabo, Oo aannu
labadayaduba xukun u wada galno. 33 Ma jiro nin noo
dhexeeya, Oo labadayadaba gacantiisa na saari kara. 34
Isagu ushiisa ha iga fogeeyo, Oo cabsidiisuna yaanay i bajin.
35 Markaas waan hadli lahaa, oo isaga kama aanan baqeen;
Waayo, anigu sidaas ma ahi.

10 Naftaydu noloshadayday la daallan tahay, Oo
joojinla'aan waan ku sii caban doonaa, Oo qadhaadhka
naftayda waan ku hadli doonaa. 2 Waxaan Ilaah ku odhan
doonaa, Ha i xukumine. Bal waxaad i tustaa waxa aad
aawadood iila diriraysid. 3 Bal miyey kuu wanaagsan tahay
inaad cidhiidhisid Oo aad quudhsatid shuqulkii gacantaada,
Oo haddana aad iftiimisid kuwa sharka ah taladooda? 4 Ma
waxaad leedahay indho binu-aadmi, Mase sida dadkaad
wax u aragtaa? 5 Wakhtigaagu ma sida wakhtiga dadkoo
kalaa? Cimrigaaguse ma sida cimriga dadkoo kalaa? 6
Oo bal ma sidaas daraaddeed baad xumaantayda u daba
joogtaa, Oo aad dembigayga u baadhaysaa, 7 In kastoo
aad ogtahay inaanan sharrow ahayn, Oo uusan jirin mid

gacantaada iga samatabbixinaya? 8 Gacmahaaga ayaa i
qabanqaabiyey oo i dhisay dhammaantay, Laakiin haddana
intaad igu soo jeesato ayaad i duminaysaa. 9 Bal xusuuso
waan ku baryayaaye inaad ii dhoobtay sidii wax dhoobo laga
sameeyey, Haddaba ma boodhkaad dib iigu celinaysaa? 10
War sow sidii caano iima aadan daadin, Oo sidii gadhoodh oo
kale sow iigama aadan dhigin? 11 Waxaad i huwisay harag
iyo hilib, Oo waxaad dhammaantay igu dhistay lafo iyo seedo.
12 Waxaad i siisay nolol iyo raallinimo, Oo booqashadaadiina
waxay xannaanaysay ruuxayga. 13 Laakiin waxyaalahaas
qalbigaaga waad ku qarisay; Oo waan ogahay in taasu ay
kugu jirto. 14 Haddaan dembaabo waad iska kay fiirsataa,
Oo ma aad caddaysid inaan dembi la'ahay. 15 Haddaan
sharrow ahay, anaa iska hoogay, Oo haddaan xaq ahayna,
innaba madaxayga kor u qaadi maayo Anigoo ceeb ka buuxa
Oo dhibaatadayda fiirinaya. 16 Oo haddii madaxaygu kor isu
qaadona, waxaad ii ugaadhsataa sida libaax oo kale, Oo
haddana wax laga yaabo ayaad igu samaysaa. 17 Waxaad ii
keensataa markhaatiyaal cusub, Oo dhirifkaagana waad
igu sii kordhisaa, Oo hadba waxaad igu soo daysaa col iyo
belaayo isu kay bedbeddela. 18 Bal maxaad iiga soo bixisay
uurkii hooyaday? Waxaa wanaagsanaan lahayd in naftu iga
baxdo iyadoo aan iluna i arag! 19 Waxaa igu habboonaan
lahayd inaan ahaado sidii wax aan jirin, Oo waxaa ii roonaan
lahayd in qabriga la ii qaado isla markii aan uurka hooyaday
ka soo baxay. 20 War cimriga noloshaydu sow wax yar ma
aha? Haddaba iska kay daa Oo i dhaaf, aan in yar nastee,
21 Intaanan tegin meesha aanan ka soo noqonayn, Oo ah
dalka gudcur iyo hooska dhimashada, 22 Kaasoo ah gudcur
qaro weyn oo ah sida mugdi dam ah, Dalkaas oo ah hooska
dhimashada, oo aan innaba nidaam lahayn, Halkaas oo
iftiinku yahay sida mugdi oo kale.

11 Markaasaa Soofar oo ahaa reer Nacamaatii u jawaabay,
oo wuxuu ku yidhi, 2 War sow waajib ma aha in laga
jawaabo erayada faraha badan? Balse ninka hadalka badan
xaq ma laga dhigaa? 3 Amase faankaagu miyuu dadka
aamusiin karaa? Oo markaad majaajilootid miyaan ninna ku
kashifi karin? 4 Waayo, waxaad leedahay, Cilmigaygu waa
daahir, Oo nadiif baan ku ahay indhahaaga hortooda. 5 Bal
muu Ilaah hadlo! Oo bal muu bushimihiisa furo isagoo kaa
gees ah! 6 Oo bal muu ku tuso waxyaalaha qarsoon ee
xigmadda ah, Waayo, way badan yihiin. Haddaba bal ogow
in Ilaah kaa jisaynayo in ka sii yar ciqaabta dembigaagu
istaahilo. 7 War miyaad baadhi kartaa Ilaah axwaalkiisa
moolka dheer? Miyaadse Ilaaha Qaadirka ah si kaamil ah u
garan kartaa? 8 Xigmaddiisu way u sarraysaa sida samada,
ee bal maxaad samayn kartaa? Oo She'oolna way ka sii
mool dheer tahay, ee maxaad garan kartaa? (Sheol h7585) 9
Qiyaasteeduna waa ka sii dheer tahay dhulka, waana ka
sii ballaadhan tahay badda oo dhan. 10 Oo isagu hadduu
dhex gudbo, wax kastana xidho, Oo uu garsoorid isugu
yeedho, bal yaa isaga hor joogsan kara? 11 Waayo, wuu
gartaa dadka waxmatarayaasha ah, Weliba xumaantana wuu
arkaa, sow kama fikirin? 12 Laakiinse ninkii waxmatare ahu
waxgarasho waa ka madhan yahay, Hubaal dadku wuxuu u
dhashaa sida qayl dameerdibadeed, 13 Haddaad qalbigaaga
hagaajisid, Oo aad isaga gacmaha u fidsatid, 14 Haddii
xumaanu gacantaada ku jirto iska fogee, Oo xaqdarrona
yaanay teendhooyinkaaga degin. 15 Hubaal markaasaad
wejigaaga kor u qaadi doontaa isagoo aan ceeb lahayn; Oo
waad adkaan doontaa, mana aad baqi doontid, 16 Waayo,
dhibaatadaada waad illoobi doontaa, Oo waxaad u xusuusan
doontaa sidii biyo ku dhaafay, 17 Oo noloshaaduna way
ka sii dhalaal dheeraan doontaa hadhkii, Oo in kastoo
gudcur jiro, waxay ahaan doontaa sida subaxda. 18 Oo
ammaan baad ahaan doontaa, maxaa yeelay, rajaa jirta,
Hareerahaagaad fiirin doontaa, oo nabaadiinona waad
ku nasan doontaa. 19 Weliba waad jiifsan doontaa, oo
waxba kuma cabsiin doonaan; Hubaal kuwa badan ayaa
raallinimo kaa baryi doona. 20 Laakiinse kuwa sharka ahu
way indhabbeeli doonaan. Mana ay heli doonaan jid ay ku
cararaan, Rajadooduna waxay ahaan doontaa nafta oo ka
dhacda.

12 Markaasaa Ayuub u jawaabay oo wuxuu ku yidhi,
2 Shakila'aan waxaad tihiin dadkii, Oo xigmad baa
idinla dhiman doonta. 3 Laakiinse aniguba waxgarasho
baan leeyahay sidiinna oo kale, Oo weliba idinkama aan
liito. Bal waxyaalahan oo kale kan aan garanaynu waa
ayo? 4 Waxaan la mid ahay sida mid saaxiibkiisu ku
maadaysto, Anoo Ilaah baryay oo isna uu ii jawaabay, Ninkii
xaq ah oo qumman waa lagu maadaystaa. 5 Kii istareexsan
fikirkiisu waa yaraystaa nasiibdarrada, Laakiinse diyaar bay
u tahay kuwa cagtoodu simbiriirixato. 6 Kuwa wax dhaca
teendhooyinkoodu way barwaaqoobaan, Oo kuwa Ilaah
ka cadhaysiiyaana ammaan bay ku joogaan, Oo Ilaahna
gacmahooduu wax kasta uga buuxshaa. 7 Laakiinse haatan
bal xayawaanka wax weyddii, oo iyana wax bay ku bari
doonaan, Iyo haadka hawada, oo iyana wax bay kuu sheegi
doonaan, 8 Amase bal dhulka la hadal, oo isna wax buu ku
bari doonaa, Oo kalluunka badduna wax buu kuu sheegi
doonaa. 9 Bal yuu yahay kan aan waxyaalahan oo dhan
ka garanayn Inay gacanta Rabbigu waxan samaysay? 10

Kaasoo gacantiisa ku haya nafta wax kasta oo nool Iyo neefta
binu-aadmiga oo dhan. 11 War sow dhegtu erayada ma kala
soocdo, Sida dhanxanagguba cuntadiisa u dhadhamiyo? 12
Odayaashu waxay leeyihiin xigmad, Oo cimriga dheerna
waxaa laga helaa waxgarasho. 13 Isagu wuxuu leeyahay
xigmad iyo xoog, Oo wuxuu leeyahay talo iyo waxgarasho.
14 Bal eeg, isagu wax buu dumiyaa, Oo wuxuu dumiyana mar
dambe lama dhisi karo, Nin buu xidhaa oo wax furi kara lama
arko. 15 Biyuhuu celiyaa, oo way iska gudhaan, Oo haddana
wuu soo daayaa, markaasay dhulka qarqiyaan. 16 Xoog iyo
xigmaduba isagay la jiraan, Oo kan la khiyaaneeyey iyo kan
wax khiyaaneeyaba isagaa iska leh. 17 Taliyayaasha wuxuu
u kaxaystaa sida booli la dhacay, Xaakinnadana nacasyo buu
ka dhigaa. 18 Wuxuu furaa boqorrada xidhan, Oo dhex-xidh
buuna u xidhaa. 19 Wadaaddadana sida booli la dhacay buu
u kaxaystaa, Oo kuwa xoogga badanna wuu afgembiyaa. 20
Kuwa la aaminayna wuu hadal beeliyaa, Oo odayaashana
waxgarashaduu ka qaadaa. 21 Amiirrada wuxuu ku shubaa
quudhsasho, Kuwa xoogga badanna suunkooduu debciyaa.
22 Wuxuu gudcurka ka soo saaraa waxyaalo mool dheer, Oo
hooska dhimashadana iftiinkuu u soo bixiyaa. 23 Quruumaha
wuu badiyaa, oo haddana wuu wada baabbi'iyaa, Oo
quruumaha wuu ballaadhiyaa, oo haddana wuu kexeeyaa,
24 Wuxuu caqliga ka qaadaa madaxda dadyowga dhulka,
Oo wuxuu iyaga ku warwareejiyaa meel cidla ah oo aan
jid lahayn. 25 Waxay wax ka haabhaabtaan gudcurka
iyagoo aan iftiin lahayn, Oo wuxuu iyaga ka dhigaa inay u
dhacdhacaan sida nin sakhraan ah.

**13** Bal eega, waxan oo dhan ishaydu waa aragtay,
Dhegtayduna waa maqashay oo way garatay. 2 Wixii
aad taqaaniin, anna waan aqaan sidoo kale, Anigu idinkama
liito innaba. 3 Sida xaqiiqada ah waxaan doonayaa inaan
Ilaaha Qaadirka ah la hadlo, Oo waxaan jeclahay inaan
Ilaah la xaajoodo. 4 Laakiinse idinku waxaad tihiin kuwa
beenta hindisa, Oo dhammaantiin waxaad tihiin dhakhtarro
aan waxtar lahayn. 5 Bal maad iska aamustaan! Taasu
xigmad bay idiin ahaan lahayd. 6 Haddaba bal xaajadayda
maqla, Oo baryootanka bushimahayga dhegaysta. 7 War
ma Ilaah aawadiis baad xaqdarro wax ugu odhanaysaan, Oo
ma isaga aawadiis baad khiyaano ugu hadlaysaan? 8 War
ma isagaad u eexanaysaan? Oo ma Ilaah aawadiis baad
u diriraysaan? 9 War miyey idiin wanaagsan tahay inuu
idin baadho? Mase sida nin loo khiyaaneeyo ayaad isaga u
khiyaanaynaysaan? 10 Sida xaqiiqada ah haddaad qarsoodi
dadka ugu kala eexatan Isagu wuu idin canaanan doonaa.
11 War sow sarraysnaantiisu idin cabsiin mayso? Oo sow
baqdintiisu idinku dhici mayso? 12 Hadalkiinna xusuusta
lahu waa maahmaahyo dambas ah, Oo dhufaysyadiinnuna
waa dhufaysyo dhoobo ah. 13 Haddaba iska aamusa, oo
iska kay daaya aan iska hadlee, Oo wixii dhici lahaaba
ha igu dheceen. 14 Haddaba hilibkayga ayaan ilkahayga
ku qaadayaa, Oo noloshaydana gacantaydaan ku ridayaa.
15 Oo in kastoo uu i dilo, weli waan rajaynayaa, Habase
yeeshee hortiisaan kula xaajoonayaa. 16 Oo weliba kaasu
wuxuu ahaan doonaa badbaadadayda, Waayo, nin aan
cibaado lahaynu hortiisa iman maayo. 17 Hadalkayga aad u
dhegaysta, Oo warramiddaydu dhegihiinna ha gasho. 18
Bal eega, hadda xaalkayga waan soo hagaajiyey, Oo waan
ogahay in xaq layga dhigayo. 19 Bal yuu yahay kan ila
doodayaa? Waayo, hadda waan iska aamusayaa oo naftuna
waa iga dhacaysaa. 20 Laba waxyaalood oo keliya ha igu
samayn, Oo anna markaas nafsaddayda wejigaaga ka qarin
maayo. 21 Gacantaada iga fogee, Oo waxyaalahaaga laga
cabsadona yaanay i bajin. 22 Oo markaas ii yeedh, oo anna
waan kuu jawaabi doonaa, Amase anigu aan hadlo oo adigu
ii jawaab. 23 Bal xumaatooyinkayga iyo dembiyadaydu waa
immisa? Bal xadgudubkayga iyo dembigayga i ogeysii. 24
Bal maxaad wejigaaga u qarinaysaa, Oo aad iigu haysataa
sidii mid cadow kuu ah? 25 Ma waxaad dhibaysaa caleen
iska bidaysa? Oo ma waxaad eryanaysaa xaab engegay?
26 Waayo, waxyaalo qadhaadh baad iga qortaa, Oo waxaad
i dhaxalsiisaa xumaatooyinkii dhallinyaranimadayda. 27 Oo
weliba cagahayga waxaad gelisaa jeebbooyin, Oo jidadkayga
oo dhanna waad wada fiirisaa, Cagahaygana xad baad
u dhigtaa. 28 Oo waxaan la mid ahay wax qudhmay oo
baabba'aya, Iyo sida dhar aboor cunay oo kale.

**14** Ninkii naagu dhashaba Cimrigiisu waa maalmo yar
iyo dhibaato miidhan. 2 Wuxuu u soo baxaa sida ubax
oo kale, oo haddana waa la gooyaa, Oo wuxuu u cararaa
sida hoos oo kale, oo innaba siima raago. 3 Haddaba
ma mid sidaas oo kalaad indhaha u kala qaadaysaa?
Oo ma anigaad xukun ila soo gelaysaa? 4 Bal yaa wax
wasakh ah wax nadiif ah ka soo bixin kara? Xataa mid
qudha oo saas yeeli karaa ma jiro. 5 Maxaa yeelay, dadka
cimrigiisu waa go'an yahay, oo inta bilood oo uu jirayo
tiradoodana adigaa haya, Oo waxaad u dhigtay soohdin
uusan dhaafi karin. 6 Bal ha nastee isaga ka sii jeeso, Ilaa
uu cimrigiisa ka dhammaysanayo sida shaqaale maalintiisa
u dhammaysto. 7 Waayo, geed dheer haddii la gooyo rajuu
leeyahay inuu mar kale soo biqlo, Iyo in laantiisa curdanka
ahu ayan joogsan. 8 In kastoo xididkiisu uu ciidda ku dhex
gaboobo, Oo ay jirriddiisiina dhulka dhexdiisa ku dhimato, 9
Biyaha urkooda ayuu ku biqli doonaa, Oo waxaa ka soo bixi

doona laamo curdan ah oo dhalato la moodo. 10 Laakiinse
ninku wuu dhintaa, wuuna iska baabba'aa, Oo ninka naftu
waa ka dhacdaa, oo bal xaggee buu joogaa isagu? 11
Biyuhu badda way ka dhammaadaan, Oo webiguna waa
gudhaa oo waa iska engegaa, 12 Sidaas oo kalaa dadku
u jiifsada oo mana uu kaco, Oo jeeray samooyinku wada
baabba'aan iyagu sooma toosi doonaan, Oo hurdadoodana
kama kici doonaan. 13 Hahe bal maad She'ool igu qarisid,
Oo bal maad meel qarsoon igu haysid ilaa cadhadaadu
dhaafto, Oo bal maad wakhti go'an ii qabatid, oo aad i soo
xusuusatid! **(Sheol h7585)** 14 Mar hadduu nin dhinto, miyuu
soo noolaanayaa? Maalmaha dadaalkayga oo dhan waan
iska sugi lahaa Ilaa uu isbeddelkaygu yimaado. 15 Waad ii
yeedhi lahayd, oo anna waan kuu jawaabi lahaa; Oo adna
waxaa damac kaa geli lahaa shuqulkii gacmahaaga. 16
Laakiinse haatan waad tirisaa tallaabooyinkayga, Balse
miyaadan dembigayga isha ku hayn? 17 Xadgudubkaygii
kolay baa lagu xidhay, Oo xumaantaydiina meel baad ku
dhuujisay. 18 Oo sida xaqiiqada ah buurtii dhacdaa waa
baabba'daa, Oo dhagaxiina meeshiisii wuu ka dhaqaaqaa.
19 Biyuhu dhagaxyaday lisaan, Oo daadkooduna wuxuu
qaada ciidda dhulka, Oo adna sidaasoo kalaad u baabbi'isaa
binu-aadmiga rajadiisa. 20 Weligaaba waad ka adkaataa
isaga, oo isna wuu iska baxaa, Oo jaahiisa waad beddeshaa,
oo waad iska dirtaa isaga. 21 Wiilashiisa waa la sharfaa,
laakiinse isagu waxba kama oga; Oo haddana hoos baa loo
ridaa, laakiinse isagu waxba kama garto iyaga. 22 Laakiinse
xanuunka jidhkiisa oo keliya buu gartaa, Oo nafsaddiisa oo
keliya ayuu u baroortaa.

**15** Markaasaa Eliifas kii reer Teemaan isagii u jawaabay,
oo wuxuu ku yidhi, 2 War nin xigmad lahu miyuu ku
jawaabaa aqoon aan waxba tarayn, Oo bal miyuu calooshiisa
ka buuxiyaa dabaysha bari? 3 Miyayse ku habboon tahay
inuu ku xaajowdo hadal aan faa'iido lahayn, Amase hadallo
uusan innaba wanaag ku samayn karin? 4 Cabsida waad
baabbi'isaa, Oo cibaadadana Ilaah hortiisa waad ka joojisaa.
5 Waayo, afkaaga waxaa wax bara xumaantaada, Oo
waxaad doorataa carrabka khaa'inka. 6 Haddaba waxaa ku
xukuma afkaaga oo aniga ma aha; Hubaal bushimahaaga
qudhooda ayaa kugu marag fura. 7 War ma ninkii binu-
aadmiga ugu hor dhashaad tahay? Mase buuraha hortood
baad soo dhalatay? 8 War talada qarsoon oo Ilaah miyaad
maqashay? Oo nafsaddaada miyaad xigmad ula hadhay? 9
War maxaad og tahay, oo aannan annagu ogayn? Oo bal
maxaad garanaysaa, oo aannan garanayn? 10 Waxaa nala
jooga rag cirro leh iyo odayaal da' weyn, Oo aabbahaa ka sii
fil weyn. 11 Ma kugu yar yihiin qalbiqabowjiska Ilaah Iyo
erayga sida qabow kuula macaamiloodaa? 12 Bal maxaa
qalbigaagu kuu fogeeyaa? Maxaase indhahaagu u gabgab
leeyihiin? 13 Oo aad ruuxaaga Ilaah ugu soo jeedisaa, Oo
erayo caynkaas ah aad afkaaga uga soo daysaa? 14 Bal
binu-aadmigu muxuu yahay oo uu daahir ahaado? Kii naagu
dhashayse muxuu yahay oo uu xaq ahaado? 15 Bal eeg,
Ilaah ma aamino kuwiisa quduuska ah, Oo xataa samooyinku
hortiisa daahir kuma aha. 16 Haddaba bal sidee buu u daahir
ahaanayaa nin karaahiyo iyo wasakhaan ah, Oo dembiga
sida biyo u cabbaa! 17 Bal i maqal, wax baan ku tusayaa, Oo
wixii aan arkay oo dhan waan kuu sheegayaa; 18 (Kuwaasoo
rag xigmad lahu ay awowayaashood ka heleen, Oo ayan
qarin, 19 Kuwaasoo dalka keligood la siiyey, Oo uusan
shisheeye innaba dhex mari jirin.) 20 Ninkii shar ahu sida
naag u foolato oo kale ayuu u xanuunsadaa cimrigiisa oo
dhan, Intaas oo ah sannadihii loo kaydiyey kuwa wax dulma.
21 Oo sanqadh cabsi leh ayaa dhegihiisa gasha, Oo wakhtiga
barwaaqadana baabbi'iyuhu waa u soo iman doonaa. 22
Isagu ma rumaysto inuu gudcurka ka noqon doono, Iyo inay
seeftu isaga sugayso. 23 Meel meel buu cunto u wareegaa
isagoo leh, Meeday? Oo wuxuu og yahay inay maalinta
gudcurku isaga u diyaar tahay. 24 Waxaa isaga bajiya dhib
iyo cidhiidhi, Oo isagay uga adkaadaan sida boqor dagaal
isu diyaariyey, 25 Maxaa yeelay, isagu gacantiisuu Ilaah ku
taagay, Oo Ilaaha Qaadirka ah kibir buu ku caasiyaa. 26
Wuxuu kula ordaa madax adag Iyo gaashaammadiisa biro
ku taagan yihiin. 27 Maxaa yeelay, wejiga ayuu ka cayilay,
Oo bowdooyinkana baruur buu ku yeeshay, 28 Oo wuxuu
degay magaalooyin baabba' ah, Iyo guryo aan lagu hoyan,
Oo u diyaarsan inay tuulmooyin burbur ah noqdaan. 29 Isagu
taajir noqon maayo, oo maalkiisuna sii raagi maayo, Oo
dhulkana ku sii waari maayo. 30 Isagu marnaba gudcur ka
bixi maayo, Oo laamihiisa olol baa qallajin doona, Oo neefta
afkiisa ayaa qaadi doonta. 31 Yuusan wax aan waxba tarayn
isku hallayn, isagoo iskhiyaaneeya, Waayo, wax aan waxba
tarayn ayaa abaalgudkiisa ahaan doona. 32 Wakhtigiisii ka
hor buu dhammaan doonaa, Oo laantiisuna ma cagaaroobi
doonto. 33 Sida canabka ayuu midhihiisa ceedhiin iska
ridi doonaa, Oo sida saytuunka ayuu ubaxiisa iska daadin
doonaa. 34 Waayo, ururka cibaadalaawayaashu wuxuu
ahaan doonaa wax aan waxba dhalin, Oo teendhooyinka
kuwa laaluushka qaatana dab baa baabbi'in doona. 35 Iyagu
waxay uuraystaan belaayo, xumaanna way dhalaan, Oo
calooshooduna waxay diyaarisaa khiyaano.

**16** Markaasaa Ayuub u jawaabay, oo wuxuu ku yidhi,
2 Anigu waan maqlay waxyaalo badan oo caynkaas
ah. Idinku dhammaantiin waxaad tihiin qalbiqabowjiyayaal
qalqalloocan. 3 Hadal dabayl ahu miyuu dhammaadaa?
Balse maxaa kaa dhirfinaya oo aad u jawaabaysaa? 4 Haddii
naftiinnu ahaan lahayd naftayda, Anigu waan u hadli kari
lahaa sidiinna oo kale, Oo hadal waan idinku kor tuuli kari
lahaa, Oo madaxaygana waan idinku ruxruxi kari lahaa. 5
Laakiinse anigu afkayga waan idinku xoogayn lahaa, Oo
tacsiyaynta bushimahayguna way idin qalbi qabowjin lahayd.
6 Anigu haddaan hadlo xanuunkaygu igama yaraado, Oo
haddaan iska aamusona miyaan in ka yar xanuunsadaa? 7
Laakiinse haatan wuu i daaliyey, Oo guutadaydii oo dhan
cidlo baad ka dhigtay. 8 Waad i qabsatay, taasuna waa
marag iga gees ah, Oo waxaa igu kaca macluulkayga, oo
fool ka fool ayuu igu markhaati furaa. 9 Isagoo cadhaysan
ayuu i dildillaacsaday, oo wuu i silciyey, Wuuna igu ilko
jirriqsaday, Oo cadowgaygii indhuhuu igu caddeeyey. 10
Iyagu afkay ii kala qaadeen, Oo quudhsasho ayay dhabanka
igaga dharbaaxeen, Oo dhammaantoodna way isu kay
wada urursadaan. 11 Ilaah wuxuu gacantooda i geliyaa
cibaadalaawayaasha, Oo wuxuu igu dhex tuuraa gacmaha
kuwa sharka ah. 12 Anigoo iska istareexsan ayuu i kala
jejebiyey, Oo intuu surka i qabtay ayuu i kala burburiyey, Oo
weliba intuu meel i qotomiyey ayuu goolibaadh iga dhigtay. 13
Qaansoolayaashiisii ayaa i hareereeya, Oo kelyahaygii ayuu
kala googooyaa, Oo xammeetidaydiina dhulkuu ku daadshaa.
14 Isagu wuu i jejebiyaa oo nabarba nabar buu iiga kor
mariyaa; Oo sidii nin xoog badan ayuu orod igula soo kacaa.
15 Korkayga waxaan ku tolay joonyad, Oo xooggaygiina
ciiddaan ku riday. 16 Wejigaygii oohin buu la beddelmay, Oo
indhaha daboolkoodana waxaa ii jooga hooskii dhimashada,
17 In kastoo aanay xaqdarro ku jirin gacmahayga, Oo uu
baryootankayguna daahir yahay. 18 Dhulkow, dhiiggayga
ha qarinin, Oo qayladayduna yaanay meelay ku nasato
lahaan. 19 Oo hadda bal eeg, markhaatigaygii wuxuu joogaa
samada, Oo kii ii dammiintaana xagga saruu joogaa. 20
Saaxiibbaday way igu qoslaan, Laakiinse indhahaygu ilmo
bay u daadiyaan xag Ilaah. 21 Bal muu jiro mid dadka Ilaah
ula hadla, Siduu nin deriskiisa ugu hadlo oo kale. 22 Waayo,
markii dhawr sannadood dhaafaan, Waxaan mari doonaa
jidka aanan mar kale dib uga soo noqonayn.

**17** Ruuxaygii waa tabardarnaaday, cimrigaygiina waa
dhammaaday, Oo qabrigu waa ii diyaar. 2 Sida
xaqiiqada ah waxaa ila jooga majaajilowyo, Oo ishayduna
waxay fiiro u leedahay ka cadhaysiintooda. 3 Haddaba
rahaamad i sii, oo dammiin ii noqo; Bal yaa jooga oo gacanta
dhaar iigu dhiibaya? 4 Waayo, qalbigooda waxgarashadii
waad ka qarisay, Oo sidaas daraaddeed iyaga ma aad
sarraysiin doontid. 5 Kii saaxiibbadiis u yeedha inay maal
ka qaybgeliyaan, Carruurtiisu way indha beeli doonaan.
6 Oo weliba isagu wuxuu iga dhigay wax ay dadku ku
halqabsadaan, Oo waxaan noqday mid ay dadku candhuuf
ku tufaan. 7 Indhahaygii murug bay la arag daranyihiin, Oo
xubnahaygii oo dhammuna waxay noqdeen sidii hoos oo
kale. 8 Dadkii toolmoonu waxan way la yaabayaan, Oo kan
aan xaqa qabinuna wuxuu ku kacayaa cibaadalaawaha. 9
Laakiinse kii xaq ahu jidkiisa wuu ku sii adkaysan doonaa, Oo
kii gacmo nadiifsan lahuna aad iyo aad buu u sii xoogaysan
doonaa. 10 Laakiinse idinku dhammaantiin bal soo noqda oo
ii kaalaya, Oo anna nin xigmad leh idinkama heli doono. 11
Cimrigaygii waa dhammaaday, Oo qasdigaygii iyo fikirradii
qalbigayguba waa baabbe'een. 12 Habeenka waxay u
beddelaan maalin, Oo waxay yidhaahdaan, Iftiinku waa u
dhow yahay gudcurka. 13 Haddaan She'ool u rajeeyo sida
gurigaygii oo kale, Ama haddaan gogoshayda gudcurka
ku dhex fidsado, **(Sheol h7585)** 14 Oo haddaan qudhunka
ku idhaahdo, Adigu waxaad tahay aabbahay, Oo aan
dirxigana ku idhaahdo, Adigu waxaad tahay hooyaday iyo
walaashay, 15 Bal markaas meeday rajadaydu? Oo bal
yaase rajadayda arki doona? 16 Waxay hoos ugu dhaadhici
doontaa qataarrada She'ool, Markaannu ciidda wada galno.
**(Sheol h7585)**

**18** Markaasaa Bildad oo ahaa reer Shuuxii u jawaabay,
oo wuxuu ku yidhi, 2 War ilaa goormaad hadallo
sii wadaysaan? War bal fiirsada, oo annana dabadeed
baannu hadlaynaa. 3 War bal maxaa sida xayawaan naloogu
tiriyaa? Oo bal maxaannu hortiinna ugu nijaasownay? 4 War
waa adiga xanaaq daraaddiis isla jeexjeexayaye Dhulka
ma daraaddaa baa looga tegayaa? Mase dhagaxa ayaa
meeshiisa laga rujinayaa? 5 Hubaal iftiinka sharrowgu wuu
demi doonaa, Oo ololka dabkiisuna siima iftiimi doono.
6 Iftiinka teendhadiisu wuxuu ahaan doonaa gudcur, Oo
laambaddiisa kor taalna way demi doontaa. 7 Tallaabooyinka
itaalkiisu way iscidhiidhin doonaan, Oo taladiisu isagay hoos
u ridi doontaa. 8 Waayo, isagu wuxuu cagta gashadaa
shabag, Oo wuxuu ku kor socdaa dabin. 9 Waxaa isaga
cedhibta ku dhegi doona dabin, Oo qool baana qabsan
doona. 10 Waxaa dhulka ugu qarsan siriq, Oo jidkana waxaa
u yaal dabin. 11 Dhinac kasta waxaa ka bajin doona cabsi,
Oo xataa gadaalna way ka soo eryan doontaa. 12 Xooggiisa
waxaa dili doonta gaajo, Oo belaayona agtiisay diyaar ku
tahay. 13 Oo waxay baabbi'in doontaa xubnaha jidhkiisa,

Oo curadka dhimashada ayaa xubnihiisa baabbi'in doona.
14 Oo isaga waa laga rujin doonaa teendhadiisa uu isku
halleeyo, Oo waxaa loo keeni doonaa boqorka cabsida. 15
Teendhadiisa waxaa ku jiri doona wax aan wixiisii ahayn,
Oo hoygiisana waxaa lagu soo kor firdhin doonaa baaruud.
16 Xididdadiisa hoose way qallali doonaan, Oo laamihiisa
sarena waa la jari doonaa. 17 Dhulka laguma xusuusan
doono, Oo jidkana magac kuma uu yeelan doono. 18 Isaga
iftiin baa gudcur looga kaxayn doonaa, Oo dunidana waa
laga eryi doonaa. 19 Oo isagu dadkiisa kuma dhex lahaan
doono wiil uu dhalay iyo mid uu wiilkiisii dhalay toona, Ama
mid ku hadha meelihii uu degganaan jiray. 20 Dadka ka
dambeeyaa waxay ka yaabi doonaan wakhtigiisa, Sidii ay
kuwii horeba uga baqeen. 21 Sida xaqiiqada ah guryaha
kuwa aan xaqa ahayn waa sidaas oo kale, Oo kii aan Ilaah
aqoon meeshiisiina waa tan.

**19** Markaasaa Ayuub u jawaabay oo wuxuu yidhi, 2
War ilaa goormaad naftayda dhibaysaan Oo aad
erayo igu burburinaysaan? 3 Toban jeer baad i caydeen,
Haddaba miyaydaan ka xishoonayn inaad saas oo xun iila
macaamilootaan? 4 Oo sida xaqiiqada ah haddaan qaldamay,
Qaladkaygu aniguu igu hadhayaa. 5 Oo sida xaqiiqada ah
haddaad iska kay weynaynaysaan, Oo aad ceebtayda igu
caddaysaan inaan dembi leeyahay, 6 Haddaba bal ogaada
in Ilaah i afgembiyey, Oo uu shabagtiisii igu wareejiyey.
7 Bal eega, dulunka daraaddiis waan u qayliyaa, laakiin
lay maqli maayo, Oo caawimaad waan u qayshadaana,
caddaaladduse ma jirto. 8 Jidkaygii ayuu ooday si aanan u
dhaafi karin, Oo wadiiqooyinkaygiina gudcur buu ka dhigay. 9
Ammaantaydii wuu iga xayuubiyey, Oo taajkiina madaxayga
wuu ka qaaday. 10 Xagga iyo xaggaaba wuu iga dumiyey,
oo baabba' waan noqday, Oo rajadaydiina sidii geed oo
kale ayuu u rujiyey. 11 Aad buu iigu cadhooday, Oo sida
mid cadowgiisa ah ayuu igu tiriyaa. 12 Ciidammadiisii oo
dhammu way wada yimaadaan, Oo jid bay dhistaan si ay
iigu kacaan, Oo teendhadayda hareeraheeda ayay degaan.
13 Walaalahay wuu iga fogeeyey, Oo kuwii aan iqiinna way
iga wada shisheeyoobeen. 14 Ehelkaygii way i dayriyeen,
Oo saaxiibbadaydiina way i illoobeen. 15 Kuwa reerkayga ku
hoyda, iyo gabdhaha addoommahayga ahuba waxay igu
tiriyaan shisheeye, Oo hortooda waxaan ku ahay ajanabi.
16 Waxaan u yeedhaa addoonkaygii, Oo in kastoo aan
afkayga ku baryo, iima jawaabo innaba. 17 Naagtaydu
waxay nacdaa neeftayda, Oo carruurtii hooyaday dhashayna
waxay nacaan baryootankayga. 18 Xataa dhallaanka yaryaru
way i quudhsadaan, Oo haddaan sara joogsado way i
caayaan. 19 Saaxiibbadaydii aan ku kalsoonaa oo dhammu
way i karahsadaan, Oo kuwii aan jeclaana way igu soo
jeesteen. 20 Haraggayga iyo hilibkaygu waxay ku dhegaan
lafahayga, Oo dirqi baan ku baxsaday. 21 Saaxiibbadayow, ii
naxa, oo ii naxa, Waayo, gacantii Ilaah baa i taabatay. 22
Maxaad sidii Ilaah iigu silcisaan? Oo bal maxaad dhibaatada
jidhkayga uga dhergi weydeen? 23 Waxaan jeclaan lahaa
in erayadayda la qoro! Iyo in kitaab gudihiis lagu qoro! 24
Iyo inay weligood dhagax kula qornaadaan Qalin bir ah iyo
rasaas! 25 Laakiinse waan ogahay in kii i soo furtay nool
yahay, Iyo inuu ugudambaysta dhulka ku istaagi doono.
26 Oo markii haraggaygu sidaas u baabba'o dabadeed,
Ayaan anigoo aan jiidh lahayn Ilaah arki doonaa, 27 Kaasoo
aan aniga qudhaydu arki doono, Oo indhahaygu ay fiirin
doonaan, oo aanay kuwa mid kale arkayn. Qalbigaygu waa
taag daranyahay. 28 Haddaad istidhaahdaan, War xaalkan
salkiisu isagaa laga helay, Bal maxaannu isaga u silcinnaa?
29 Si aad u ogaataan in xukun jiro, Waxaad ka cabsataan
seefta, Maxaa yeelay, cadhadu waxay keentaa taqsiirta
seefta.

**20** Markaasaa Soofar oo ahaa reer Nacamaatii u jawaabay,
oo wuxuu yidhi, 2 Haddaba waxaa ii jawaaba
fikirradayda, Oo sababtu waxay tahay degdegga igu jira. 3
Waxaan maqlay canaanta i ceebaysa, Oo waxaa ii jawaabta
waxgarashadayda. 4 Miyaadan ogayn in waayihii hore
iyo Tan iyo waagii binu-aadmiga dhulka la saaray 5 Ay
guulaysashada sharrowyadu gaaban tahay, Oo farxadda
cibaadalaawayaashuna ay daqiiqad qudha tahay? 6 In
kastoo sarrayntiisu ay samada korto, Oo madaxiisuna uu
daruuraha gaadho, 7 Wuxuu weligiis u baabbi'i doonaa sida
saxaradiisa oo kale. Oo kuwii isaga arki jiray waxay odhan
doonaan, War meeh isagii? 8 Sida riyo ayuu u libdhi doonaa,
oo lama heli doono, Hubaal waxaa loo eryi doonaa sida
riyada habeenka. 9 Ishii isaga aragtay mar dambe ma ay arki
doonto, Oo meeshiisiina mar dambe uma ay jeedi doonto.
10 Carruurtiisu waxay wax ka baryi doonaan masaakiinta,
Oo gacmahooduna dib bay u celin doonaan maalkiisa. 11
Lafihiisana waxaa ka buuxa xoogga dhallinyaranimada,
Laakiinse ciidda dhexdeeduu la jiifsan doonaa. 12 In kastoo
xumaantu afkiisa la macaan tahay, In kastoo uu carrabkiisa
ku hoos qarsado, 13 In kastoo uu kaydsado, oo uusan iska
sii dayn, Laakiinse uu afkiisa ku sii haysto, 14 Kolleyba
cuntadiisu mindhicirkiisay ku beddelantaa, Oo waxay uurkiisa
ku noqataa waabayo jilbis. 15 Isagu maal buu liqay, laakiinse
mar kaluu soo mantagi doonaa, Oo Ilaah baa calooshiisa ka
soo saari doona. 16 Wuxuu nuugi doonaa mariidka jilbisyada,

Oo waxaa isaga dili doona mas carrabkiis. 17 Oo ma uu fiirin
doono webiyada, Iyo durdurrada la barwaaqaysan malabka
iyo subagga. 18 Wixii uu ku hawshooday wuu soo celin
doonaa, oo ma uu liqi doono, Oo maalka uu faa'iidada u
helayna siduu yahay uguma uu farxi doono. 19 Waayo,
wuxuu dulmay oo dayriyey masaakiinta, Oo wuxuu xoog
ku qaatay guri uusan dhisin. 20 Uurkiisu xasilloonaan ma
lahayn, Taas daraaddeed waxa uu jecel yahay oo dhan
waxba kama uu badbaadin doono. 21 Wuxuu liqay wax ka
hadhay lama arkin, Sidaas daraaddeed barwaaqadiisu siima
raagi doonto. 22 Markuu dheregsan yahay ayuu cidhiidhi
dhex geli doonaa, Oo mid kasta oo belaayaysan gacantiisa
ayaa ku soo degi doonta. 23 Markuu ku dhow yahay inuu
calooshiisa buuxsado, Ayaa Ilaah wuxuu ku soo tuuri doonaa
kulaylka cadhadiis, Oo wuu ku soo shubi doonaa intuu
wax cunayo. 24 Wuu ka carari doonaa hubka birta ah, Oo
qaansada naxaasta ahu fallaadh bay ka dhex dusin doontaa.
25 Wuu soo jiidaa, kolkaasay jidhkiisa ka soo baxdaa, Hubaal
caaradda dhalaalaysa ayaa beerkiisa ka soo baxda, Oo
cabsi baa isaga ku dhacda. 26 Gudcurka oo dhanna waxaa
meel loogu kaydiyey khasnadihiisa; Oo dab aan la afuufin
ayaa isaga dhammayn doona, Wuuna baabbi'in doonaa
waxa teendhadiisa ku dhex hadhay. 27 Samooyinku waxay
daaha ka qaadi doonaan xumaantiisa, Oo dhulkuna isaguu
ku kici doonaa. 28 Hodanka reerkiisu wuu ka dhammaan
doonaa, Oo maalinta cadhada Ilaah ayaa maalkiisu libdhi
doonaa. 29 Intaasu waxaa weeye qaybta ninkii shar ahu
uu xagga Ilaah ka helayo, Iyo wixii Ilaah dhaxal ahaan ugu
amray.

21 Markaasaa Ayuub u jawaabay oo wuxuu ku yidhi,
2 Maqla oo warkayga aad u dhegaysta, Oo tanuna
ha noqoto wixii aad igu qalbiqabowjisaan. 3 Bal mar ii
oggolaada aan hadlee, Oo kolkii aan hadlo dabadeed iska sii
majaajilooda. 4 Balse anigu ma dad baan ka ashtakoonayaa?
Maxaan u ahaan waayay mid aan dulqaadan? 5 Bal i eega,
oo yaaba, Oo afkiinna gacanta saara. 6 Oo xataa markaan
soo xusuusto waan welwelaa, Oo jidhkaygana waa hoog iyo
ba'. 7 Bal maxay kuwa sharka ahu u noolaanayaan? Oo ay
u gaboobayaan? Balse maxay xoog badan u yeeshaan? 8
Farcankoodu iyagoo la jooga hortooduu ku xoogaystaa, Oo
dhashoodiina hortooday ku dhisan yihiin. 9 Reerahoodu
cabsi way ka ammaan galeen, Oo ushii Ilaahna iyaga
ma kor saarna. 10 Dibidoodu way dhalaan, oo marnaba
madhalays ma noqdaan, Sacyahooduna way dhalaan, dhicis
mana keenaan. 11 Dhallaankooda dibadday u baxshaan
sidii adhi oo kale, Oo carruurtooduna way cayaaraan.
12 Waxay ku gabyaan daf iyo kataarad, Oo dhawaaqa
biibiilaha way ku reyreeyaan. 13 Cimrigooda waxay ku
dhammaystaan barwaaqo, Oo dabadeedna daqiiqad ayay
She'ool ku dhaadhacaan. (Sheol h7585) 14 Laakiin waxay Ilaah
ku yidhaahdeen, War naga tag, Waayo, dooni mayno aqoonta
jidadkaaga. 15 Waa maxay Ilaaha Qaadirka ah, oo aan u
adeegayno? Balse maxaa faa'iido ah oo aannu ka helaynaa,
haddaan isaga u tukanno? 16 Bal eeg, barwaaqadoodii
gacantooda kuma jirto, Kuwa sharka ahna taladoodu way iga
fog tahay. 17 Immisa jeer baa laambadda kuwa sharka ah la
demiyaa? Oo immisa jeer baa belaayo ku kor degtaa? Oo
immisa jeer baa Ilaah isagoo cadhaysan xanuun u qaybiyaa?
18 Oo ay sababtaas aawadeed u noqdaan sidii xaab dabayl
ka horreeya, Iyo sidii buunshe uu duufaanu kaxeeyo? 19
Idinku waxaad tidhaahdaan, Ilaah xumaantiisii wuxuu u
kaydiyaa sharrowga carruurtiisa. Haddaba isagu sharrowga
ha ugu abaalgudo si uu laftigiisu u ogaado aawadeed. 20
Indhihiisu ha arkeen halligaaddiisa, Oo isagu ha cabbo
Ilaaha Qaadirka ah cadhadiisa. 21 Waayo, waa maxay
farxadda uu reerkiisa ka helo, Markii cimrigiisa dhexda laga
gooyo? 22 Bal ma Ilaah baa wax la baraa? Maxaa yeelay,
isagaa xukuma xataa kuwa sare. 23 Mid baa dhinta isagoo
xooggiisu ku dhan yahay, Oo istareexsan oo xasilloon, 24
Oo aad u buuran, Oo dhuuxa lafihiisuna qoyan yahay. 25 Oo
mid kalena wuxuu ku dhintaa naf qadhaadh, Isagoo aan
weligiis wanaag dhedhemin. 26 Habase yeeshee isku si bay
ciidda u dhex jiifsadaan, Oo dirxi baa korkooda daboola. 27
Bal eega, anigu waan ogahay fikirradiinna, Iyo xeesha aad
qaldan igu hindisaysaan. 28 Waayo, waxaad tidhaahdaan,
War meeh gurigii amiirku? Oo meeday teendhadii sharrowgu
ku dhex hoyan jiray? 29 Miyeydaan weyddiin kuwa jidka
mara? Oo miyeydaan garanayn calaamooyinkooda? 30
Iyo in ninkii sharrow ah loo celiyey maalinta belaayada?
Iyo in hore loogu sii kaxaynayo maalinta cadhada? 31 Bal
yaa jidkiisa isaga hortiisa ugu caddayn doona? Oo bal yaa
isaga ka abaalmarin doona wixii uu sameeyey? 32 Laakiinse
isaga waxaa loo qaadi doonaa xabaasha, Oo qabrigiisa waa
la ilaalin doonaa. 33 Waxaa isaga u macaanaan doonta
ciidda dooxada, Oo dadka oo dhammuna isagay soo daba
kici doonaan, Sida kuwii aan tirada lahayn oo isagii ka
horreeyeyba ay u dhinteen. 34 Haddaba bal maxaad si
aan waxba tarayn iigu qalbiqabowjinaysaan, Maxaa yeelay,
jawaabihiinnii been oo keliya ayaa ku hadhay?

22 Markaasaa Eliifas oo ahaa reer Teemaan u jawaabay,
oo wuxuu ku yidhi, 2 Ma nin baa Ilaah wax u tari kara?
Hubaal kii xigmad lahu isagaa wax isu tara. 3 Balse ma

Ilaaha Qaadirka ah baa xaqnimadaada ku farxa? Mase
faa'iido bay u tahay isaga inaad jidkaaga qummaatisid?
4 War ma cabsidaada daraaddeed buu kuu canaantaa?
Oo saas daraaddeed miyuu dacwad kuula galaa? 5 Sow
sharkaagu ma badna? Xumaatooyinkaagu dhammaad ma
laha. 6 Waayo, sababla'aan baad walaalkaa rahaamad
uga qaadatay, Oo kuwii arradnaana dharkoodii baad ka
mudhuxsatay. 7 Kii daallanaana ma aadan siin biyo uu cabbo,
Oo kii gaajaysnaana cunto baad ka hagratay. 8 Laakiinse
ninkii xoog badnaa isagaa dhulka haystay; Oo ninkii sharaf
lahaana isagaa dalka degganaa. 9 Carmallada baad gacan
madhnaan ku eriday, Oo agoonta gacmahoodiina waa la
jebiyey. 10 Sidaas daraaddeed waxaa hareerahaaga ku
wareegsan dabinno, Oo waxaa ku dhibaya cabsi kedis
ah, 11 Ama gudcur aadan waxba ku arki karin, Oo waxaa
ku qariya biyo aad u badan. 12 War sow Ilaah kuma jiro
samada sare? Oo bal eega xiddigaha dheeraantooda iyo
siday u sarreeyaan! 13 Oo adna waxaad leedahay, War
Ilaah muxuu yaqaan? Oo gudcurka qarada leh miyuu wax
ku dhex xukumi karaa? 14 Waxaa isaga ku wareegsan
daruuro qaro waaweyn, si uusan wax u arag, Oo isagu
wuxuu ku socdaa wareegga samada. 15 War ma waxaad
doonaysaa inaad sii haysatid jidkii hore Ee sharrowyadu ku
socon jireen? 16 Iyaba waxaa la dhufsaday wakhtigoodii ka
hor, Oo aasaaskoodiina daad baa baabbi'iyey. 17 Waxay
Ilaah ku yidhaahdeen, War naga tag, Bal maxaa Ilaaha
Qaadirka ahu nagu samayn karaa? 18 Laakiin isagu wuxuu
guryahooda ka buuxiyey waxyaalo wanwanaagsan; Talada
sharrowguse way iga fog tahay. 19 Kuwa xaqa ahu way
arkaan oo way farxaan, Oo kuwa aan xaqa qabinuna way ku
qoslaan oo ku majaajiloodaan, 20 Waxayna yidhaahdaan,
Sida xaqiiqada ah kuwii nagu kacay waa la baabbi'iyey,
Oo kuwoodii hadhayna dab baa liqay. 21 Haddaba isaga
la heshii, oo iska nabdoonow, Waayo, sidaasaa wanaag
kuugu iman doonaa. 22 Haddaba waan ku baryayaaye,
sharciga afkiisa ka aqbal, Oo erayadiisana qalbigaaga geli.
23 Waa lagu dhisi doonaa haddaad Ilaaha Qaadirka ah u
noqotid, Oo aad xaqdarrada teendhooyinkaaga ka fogaysid.
24 Khasnaddaada waxaad ku xoortaa ciidda, Oo dahabka
Oofirna waxaad ku dhex tuurtaa dhagaxyada durdurka,
25 Oo Ilaaha Qaadirka ahuna wuxuu kuu noqon doonaa
khasnad, Iyo lacag qiime badan. 26 Oo markaasaad Ilaaha
Qaadirka ah ku farxi doontaa, Oo wejigaagana Ilaah baad
kor ugu qaadi doontaa. 27 Oo isagaad u tukan doontaa, oo
isna wuu ku maqli doonaa, Oo adna waxaad bixin doontaa
waxyaalihii aad nidartay. 28 Adiguna wax baad amri doontaa,
oo waa laguu adkayn doonaa; Oo jidadkaaguna iftiin bay
lahaan doonaan. 29 Markii hoos laguu tuuro, waxaad odhan
doontaa, Waa lay sarraysiinayaa, Oo qofkii hooseeyana
isagaa badbaadin doona. 30 Oo wuxuu samatabbixin doonaa
kii aan xaq qabin; Hubaal isaga waxaa lagu samatabbixin
doonaa nadiifsanaanta gacmahaaga.

23 Markaasaa Ayuub u jawaabay oo wuxuu ku yidhi, 2
Xataa maantadan guryankayga cabashada ahu waa
qadhaadh yahay, Oo gacanta i saaranuna waa ka sii daran
tahay cabashadayda. 3 Waxaan jeclaan lahaa inaan ogaado
meeshaan isaga ka heli karo, Si aan kursigiisa ugu imaado! 4
Dacwadayda ayaan hortiisa ku diyaarin lahaa, Oo afkaygana
hadallo dood ah baan ka buuxin lahaa. 5 Waxaan jeclaan
lahaa inaan ogaado erayada uu iigu jawaabayo, Oo aan
garto bal waxa uu igu odhanayo. 6 Ma wuxuu igula diriri lahaa
xooggiisa badan? Maya, laakiinse wuu i maqli lahaa. 7 Kii
qummanu halkaasuu isaga kula xaajoon kari lahaa, Oo anna
saasaan xaakinkayga uga samatabbixi lahaa weligayba.
8 Bal eega, hore baan u socdaa, laakiinse isagu halkaas
ma joogo, Oo dib baan u socdaa, laakiinse ma aan heli
karo. 9 Oo waxaan tagaa xagga bidix markuu shaqaynayo,
laakiinse uma aan jeedi karo; Oo wuxuu ku dhuuntaa xagga
midig laakiinse kama arki karo. 10 Laakiinse wuu yaqaan
jidkaan maro, Oo markuu i tijaabiyo waxaan u soo bixi
doonaa sida dahab oo kale. 11 Cagtaydu waxay ku adkaatay
tallaabooyinkiisa, Jidkiisii waan xajiyey, oo dhanna ugama
aan leexan. 12 Dib ugama noqon amarkii bushimihiisa, Oo
erayadii afkiisana waxaan u hayay wax ka qiimo badan
cuntada aanan ka maarmin. 13 Laakiinse wax qudha ayuu
goostay, bal yaa ka leexin kara? Oo wixii naftiisu doonaysaba
wuu sameeyaa. 14 Waayo, wuxuu oofiyaa wixii la ii amray,
Oo waxyaalo badan oo saasoo kale ah ayuu maankiisa ku
hayaa. 15 Sidaas daraaddeed ayaan hortiisa uga naxaa, Oo
markaan ka fikiraba waan ka baqaa isaga. 16 Waayo, Ilaah
ayaa qalbigayga itaal darreeyey, Oo Ilaaha Qaadirka ah
ayaa iga nixiyey, 17 Maxaa yeelay, gudcurka hortiis layma
baabbi'in, Oo gudcurkii qarada lahaana wejigayga kama uu
daboolin.

24 Ilaaha Qaadirka ahu muxuu wakhtiyo u kaydin waayaa?
Kuwa isaga yaqaanse maxay maalmihiisa u arki
waayaan? 2 Waxaa jira kuwa soohdinta dalka durkiya, Oo
waxay xoog ku dhacaan adhyo, kolkaasay daajiyaan. 3
Oo waxay iska kaxaystaan dameerka agoonta, Oo waxay
rahaamad u qaataan naag carmal ah dibigeed. 4 Saboolka
baahan ayay jidka ka leexiyaan, Oo masaakiinta dhulkana
dhammaantood way wada dhuuntaan. 5 Bal eeg, sida
dameerdibadeedyo lamadegaanka jooga Ayay shuqulkooda

ugu baxaan, iyagoo cunto aad u doonaya; Cidladuna
carruurtooda cuntay u soo bixisaa. 6 Cuntadooda waxay
ka goostaan berrinka, Oo waxay xaabxaabaan canabka
kuwa sharrowyada ah. 7 Oo habeenkii oo dhan iyagoo
qaawan oo aan dhar lahayn ayay jiifsadaan, Oo dhaxanta
waxay ka huwadaanna ma leh. 8 Waxaa iyaga qoya roobka
buuraha, Oo gabbaadla'aan daraaddeed ayay dhagaxa
u dugsadaan. 9 Waxaa jira kuwa agoonta naaska ka
dhufsada, Oo masaakiintana rahaamad ka qaata, 10 Sidaas
daraaddeed waxay warwareegaan iyagoo qaawan oo aan
dhar qabin, Oo iyagoo gaajaysan ayay xidhmooyinka sidaan.
11 Waxay saliid ku sameeyaan nimankaas derbiyadooda
gudahooda, Macsarooyinkoodana way tuntaan, iyagoo
harraadsan. 12 Dadku magaalooyinka way ka cabaadaan,
Oo nafta kuwa dhaawacanuna way qaylisaa, Laakiinse
Ilaah nacasnimadaa ma fiiriyo. 13 Kuwaasu waxay ka mid
yihiin kuwa nuurka ku caasiyooba, Oo jidadkiisa ma ay
yaqaaniin, Oo dhabbayaashiisana ma ay sii hayaan. 14
Gacankudhiigluhu kaaha waaberi wuu la soo kacaa, oo
wuxuu dilaa miskiinka iyo saboolka baahan, Oo habeenkiina
isagu waa sida tuug oo kale. 15 Oo isha dhillayguna
waxay sugtaa fiidka, Oo wuxuu isyidhaahdaa, Ninna ima
arki doono, Oo wuu hagoogtaa. 16 Oo goor gudcur ah
ayay guryaha dhacaan, Oo maalinnimadana meel bay isku
xidhaan, Oo iftiinka maba yaqaaniin. 17 Waayo, subaxnimadu
dhammaantood waxay u tahay sida hooska dhimashada,
Maxaa yeelay, waxay yaqaaniin cabsida hooska dhimashada.
18 Isagu biyaha dushooda wuu ku dheereeyaa, Qaybtoodii
dhulkaa lagu habaaray, Isagu uma leexdo xagga jidka
beeraha canabka ah. 19 Biyaha barafka waxaa dhammaysta
abaar iyo kulayl, Oo sidaasoo kalaa She'oolna u galaa
kuwii dembaabay. **(Sheol h7585)** 20 Uurkii hooyadiis waa
illoobi doonaa isaga; jidhkiisana waxaa cuni doona oo
macaansan doona dirxiga, Oo mar dambena isaga lama
xusuusan doono, Oo kii xaqdaranuna wuxuu u jabi doonaa
sida geed oo kale. 21 Isagu wuxuu baabbi'iyaa madhashada
aan carruurta dhalin; Oo carmalkana wax wanaagsan uma
sameeyo. 22 Oo weliba kii xoog badanna itaalkiisuu ku jiidaa;
Oo markuu kacana nafta waa laga rajo beelaa. 23 Ilaahna
wuxuu iyaga siiyaa meel ammaan ah, oo halkaasay isku
halleeyaan, Jidadkoodana ishuu ku hayaa. 24 Iyaga waa la
sarraysiiyaa, laakiin in yar dabadeed way wada baabba'aan;
Hubaal iyaga waa la hoosaysiiyaa, oo jidka ayaa looga
tuuraa sida kuwa kale oo dhan, Oo waxaa loo jaraa sida
sabuul hadhuudh oo kale. 25 Oo haddayan saas ahayn, yaa
igu caddayn kara inaan beenlow ahay, Oo hadalkaygase
yaa ka dhigi kara wax aan waxtar lahayn?

**25** Markaasaa Bildad oo ahaa reer Shuuxii u jawaabay, oo
wuxuu ku yidhi, 2 Dowladnimo iyo cabsiba isagaa leh,
Oo meelihiisa sarena nabad buu ka dhigaa. 3 Ciidammadiisu
ma tiray leeyihiin? Oo yuu yahay kan aan iftiinkiisu ku soo
bixin? 4 Balse sidee baa nin u kari karaa inuu Ilaah hortiisa
xaq ku ahaado? Mid naagu dhashayse sidee buu u karaa
inuu nadiif ahaado? 5 Bal eeg, xataa dayuxu hortiisa nuur
kuma leh, Oo xiddiguhuna hortiisa daahir kuma aha. 6 Intee
buu ka sii liitaa nin dirxi ahu! Iyo binu-aadmiga dirxiga ahu!

**26** Markaasaa Ayuub u jawaabay oo wuxuu ku yidhi,
2 Sidee baad u caawisay midka aan itaalka lahayn!
Oo kan ayan gacantiisu xoogga lahayn sidee baad u
badbaadisay! 3 Sidee baad ula talisay kan aan xigmadda
lahayn! Oo aad u muujisay aqoon wanaagsan! 4 Yaad
erayo kula hadashay? Oo yaa ruuxiisu xaggaaga ka soo
baxay? 5 Kuwii dhintayna way ku hoos gariiraan Biyaha iyo
waxyaalaha dhex deggan. 6 She'ool hortiisuu yaal isagoo
qaawan, Oo Halligaadduna dabool ma leh. **(Sheol h7585)** 7
Isagu woqooyiga wuxuu ku kala bixiyaa meel madhan, Oo
dhulkana wuxuu ka laalaadshaa wax aan waxba ahayn.
8 Biyaha wuxuu ku xidhaa daruurihiisa qarada waaweyn;
Oo daruurtuna hoostooda kama dillaacdo. 9 Wuxuu xidhaa
wejiga carshigiisa, Oo daruurtiisana wuu ku kala bixiyaa. 10
Biyaha dushooda wuxuu ku wareejiyey soohdin Kala xidha
nuurka iyo gudcurka. 11 Tiirarka samadu way gariiraan, Oo
waxay ka yaabaan canaantiisa. 12 Badda ayuu xooggiisa ku
aamusiiyaa, Oo kibirkana waxgarashadiisuu ku dhuftaa. 13
Samooyinka waxaa lagu sharraxay Ruuxiisa, Gacantiisuna
waxay mudday abeesada dheeraysa. 14 Bal eeg, waxanu
waa darafyadii jidadkiisa uun; Oo inta isaga laga maqlaana
yaraan badanaa! Laakiinse bal yaa onkodka xooggiisa garan
kara?

**27** Oo haddana Ayuub ayaa hadalkiisii sii waday, oo
wuxuu yidhi, 2 Waxaan ku dhaartay Ilaaha nool
oo xaqayga iga qaaday, Kaasoo ah Ilaaha Qaadirka ah
oo naftayda dhibay; 3 (Waayo, naftaydii weli waa igu
jirtaa, Oo ruuxii Ilaahna weli wuxuu ku jiraa sankayga
labadiisa dul.) 4 Hubaal bushimahaygu xaqdarro ku hadli
maayaan, Oo carrabkayguna khiyaano sheegi maayo. 5
Ilaah ha iga fogeeyo inaan xaq idinka dhigo, Jeeraan dhinto
daacadnimadayda iska tuuri maayo. 6 Xaqnimadayda waan
xajisanayaa, oo iska sii dayn maayo, Oo qalbigaygu i
ceebayn maayo intaan noolahay oo dhan. 7 Cadowgaygu
sida sharrow ha noqdo, Oo kii igu kacaana sida mid xaqdaran
ha noqdo. 8 In kastoo uu faa'iido helo, cibaadalaawaha
rajadiisu waa maxay, Markii Ilaah naftiisa qaado? 9 Ilaah

miyuu qayladiisa maqli doonaa, Markii dhib ku yimaado?
10 Miyuu Ilaaha Qaadirka ah ku farxi doonaa? Oo miyuu
goor kasta Ilaah baryi doonaa? 11 Waxaan idin barayaa wax
gacanta Ilaah ku saabsan, Oo waxa Ilaaha Qaadirka ah la
jirana idinka qarin maayo. 12 Bal eega, idinku kulligiin waad
aragteen, Haddaba bal maxaad dhammaantiin nacasyo
u wada noqoteen? 13 Intanu waa qaybta uu Ilaah ninkii
sharrow ah u kaydiyo, Iyo dhaxalka kuwa dadka dulma
ay Ilaaha Qaadirka ah ka helaan. 14 Carruurtiisu hadday
tarmaan, kolleyba waxaa dili doonta seef, Oo carruurtiisuna
cunto kama dhergi doonaan. 15 Kuwii isaga ka hadhana
dhimashaa xabaali doonta, Oo carmalladiisuna uma ay
barooran doonaan. 16 In kastoo uu lacag u taalaysto sida
ciidda oo kale, Oo uu dharna u diyaarsado sida dhoobada
oo kale, 17 Isagaa diyaarin doona, laakiinse waxaa xidhan
doona kan xaqa ah, Oo lacagtana waxaa qaybsan doona
kan aan xaqa qabin. 18 Gurigiisa wuxuu u dhisaa sida buul
caaro oo kale, Iyo sida waab waardiye samaysto. 19 Isagoo
taajir ah ayuu seexdaa, laakiinse lama soo ururin doono,
Indhihiisuu kala qaadaa, oo waxba ma jiro. 20 Naxdin baa
isaga qarqin doonta sida biyo daad ah, Oo habeenkiina
waxaa isaga la tegi doona duufaan. 21 Waxaa isaga kaxaysa
dabaysha bari, oo isna wuu tagaa, Oo meeshiisana way ka
xaaqdaa. 22 Waayo, Ilaah baa isaga wax ku tuuri doona,
umana tudhi doono; Oo sharrowgu wuxuu jeclaan lahaa
inuu gacantiisa ka cararo. 23 Dadku way ku sacbin doonaan
isaga, Oo meeshiisana foodhi bay kaga saari doonaan.

**28** Hubaal lacagtu waxay leedahay god laga qodo, Oo
dahabkuna wuxuu leeyahay meel lagu safeeyo. 2 Birta
waxaa laga soo bixiyaa ciidda, Oo naxaastana waxaa laga
dhalaaliyaa dhagaxa. 3 Dadku gudcurkuu dhammeeyaa,
Oo tan iyo soohdinta ugu shishaysana waxay baadhaan
Dhagaxyada ku jira gudcurka qarada leh iyo hooska
dhimashada. 4 Isagu god dheer ayuu ka qodaa meel ka fog
meesha dadku deggan yahay. Iyaga waxaa illooba qofka ag
mara; Oo waxay ka laallaadaan meel dadka ka fog, oo hor
iyo dib bay u ruxmadaan. 5 Cuntadu dhulkay ka soo baxdaa,
Oo dhankiisa hoosena wuu rogmadaa sida wax dabku rogo
oo kale. 6 Dhagaxyadiisu waa meeshii dhagaxyo safayr
ah, Wuxuuna leeyahay dahab boodh ah. 7 Wadiiqadaas
haadka adagu ma yaqaan, Oo gorgorka ishiisuna ma ay
arag, 8 Bahallada kibirka lahu kuma ay joogsan, Oo libaaxa
cadhaysanina ma uu ag marin. 9 Isagu gacantiisuu soo
fidiyaa oo wuxuu saaraa dhagaxa adag, Oo buurahana
wuu afgembiyaa oo xididdaduu ku rujiyaa. 10 Dhagaxyada
dhexdooda wuxuu ka jeexaa keliyo, Oo ishiisuna wax kasta
oo qaali ah way aragtaa. 11 Wuxuu xidhaa durdurrada
si ayan u dareerin, Oo waxa qarsoonna wuxuu u soo
bannaan bixiyaa iftiinka. 12 Laakiinse waa xaggee meesha
xigmadda laga helaa? Oo waxgarashada meesheeduse
waa xaggee? 13 Dadku qiimaheeda ma yaqaan, Oo kuwa
nool dalkoodana lagama helo. 14 Moolku wuxuu leeyahay,
Iguma jirto, Badduna waxay leedahay, Aniga ilama jirto.
15 Dahab laguma heli karo, Lacagna looma miisaamo. 16
Laguma qiimayn karo dahabka Oofir, Ama dhagaxa qaaliga
ah oo onika la yidhaahdo ama xataa dhagaxa safayr la
yidhaahdo. 17 Dahab iyo madarad toona uma qalmi karaan,
Oo beddelkeeduna ma noqon karo jawhar laga sameeyo
dahab saafi ah. 18 Waxba lagama sheegi doono dhagax
cas oo raamood la yidhaahdo, amase madarad, Hubaal
xigmadda qiimaheedu waa ka sii sarreeyaa luul. 19 Dhagaxa
tobasiyos la yidhaahdo ee Itoobiya ka yimaadana uma
qalmi doono, Oo xataa dahab saafi ahna laguma qiimayn
doono. 20 Haddaba xigmaddu xaggee bay ka timaadaa?
Oo waxgarashada meesheeduse waa xaggee? 21 Maxaa
yeelay, way ka qarsoon tahay kuwa nool indhahooda,
Oo haadka hawadana waa laga deday. 22 Halligaadda
iyo Dhimashadu waxay leeyihiin, Dhegahayaga ayaannu
warkeeda ku maqalnay. 23 Ilaah ayaa jidkeeda garanaya,
Oo isagaa meesheeda yaqaan. 24 Waayo, isagu wuxuu
fiiriyaa dunida darfaheeda, Oo wuxuu u jeedaa inta samada
ka hoosaysa oo dhan, 25 Markuu dabaysha miisaamo,
Oo uu biyahana qiyaaso. 26 Markuu roobka qaynuun u
sameeyey, Oo uu hillaaca onkodkana jid u sameeyey, 27
Ayuu arkay, oo ka hadlay, Oo intuu adkeeyey ayuu weliba
baadhay. 28 Oo wuxuu dadka ku yidhi, Bal eega, Sayidka ka
cabsashadiisa ayaa xigmad ah, Oo in sharka laga fogaadona
waa waxgarasho.

**29** Oo haddana Ayuub hadalkiisuu sii waday, oo wuxuu
yidhi, 2 Waxaan jeclaan lahaa inaan ahaado sidii
waayihii hore, Iyo sidii aan ahaan jiray markii Ilaah i dhawri
jiray, 3 Markay laambaddiisu madaxayga ku ifin jirtay, Oo
aan nuurkiisa gudcurka ku dhex mari jiray, 4 Markii aan
xoog lahaan jiray, Oo qarsoodiga Ilaahna teendhadayda
saarnaan jiray, 5 Markii Ilaaha Qaadirka ahu ila jiri jiray,
Oo carruurtayduna ay hareerahayga joogi jireen, 6 Markay
tallaabooyinkaygu subagga la barwaaqoobi jireen, Oo ay
webiyaasha saliidda ahu dhagaxa iiga soo shubmi jireen! 7
Markaan magaalada iriddeeda u bixi jiray, Oo aan kursigayga
meel bannaan ku diyaarin jiray. 8 Dhallinyaradu intay i
arkaan ayay dhuuman jireen, Oo odayaashuna intay sara
joogsadaan ayay istaagi jireen, 9 Amiirraduna intay hadalka

joojiyaan, Ayay afka gacanta saari jireen. 10 Ragga gobta
ahuna way aamusi jireen, Oo carrabkoodiina dhabxanagguu
ku dhegi jiray. 11 Waayo, markii dhegu i maqasho, way ii
ducayn jirtay, Oo iluna markay i aragto, way ii marag furi
jirtay. 12 Maxaa yeelay, waxaan samatabbixin jiray miskiinka
qaylinaya, Iyo weliba agoonka aan wax u kaalmeeya lahayn.
13 Ka halligaadda ku dhow ducadiisa ayaa igu soo degi
jirtay, Oo ta carmalka ahna qalbigeeda waan ka farxin jiray
ilaa ay gabay la rayrayso. 14 Waxaan huwan jiray xaqnimo,
oo iyana dhar bay ii noqon jirtay, Oo caddaaladdayduna
waxay ii ahaan jirtay sida khamiis iyo cimaamad oo kale. 15
Kuwa indhaha la' indho baan u ahaan jiray, Kuwa curyaanka
ahna cago baan u ahaan jiray. 16 Aabbaan u ahaan jiray
saboolka baahan, Oo ka aanan aqoonna xaalkiisa waan
baadhi jiray. 17 Ka xaqa daran daamankiisa waan jebin jiray,
Oo wixii uu dhufsadana ilkihiisaan ka soo bixin jiray. 18
Markaasaan is-idhi, Buulkaygaan ku dhex dhiman doonaa,
Oo cimrigayguna wuxuu u badan doonaa sida cammuudda
oo kale. 19 Xididkaygu biyaha xaggooduu u faafayaa, Oo
laamahaygana habeenkii oo dhan waxaa saaran sayax.
20 Sharaftaydu way igu cusub tahay, Oo qaansadayduna
gacantayday ku cusboonaatay. 21 Dadku dhegtuu ii dhigi
jiray, oo i sugi jiray, Oo taladayda aawadeedna way u aamusi
jireen. 22 Weligood igama ay daba hadlin, Oo hadalkayguna
korkooduu ku soo dhibci jiray. 23 Oo waxay ii dhawri jireen
sidii roobka oo kale, Oo waxay afkooda u kala furi jireen
sidii roobka dambe loo sugo. 24 Waan u af caddayn jiray
markay qalbi jabaan, Oo nuurkii jaahaygana hoos uma ay
tuuri jirin. 25 Waxaan dooran jiray jidkooda, oo sida nin
madax ah ayaan u fadhiisan jiray, Oo waxaan u dhaqmi jiray
sidii boqor ciidan dhex fadhiya, Iyo sidii mid u tacsiyeeya
kuwa baroorta.

**30** Laakiinse haatan waxaa igu majaajilooda kuwa iga da'
yar Oo aan aabbayaashood quudhsan jiray inay xataa
la fadhiistaan eeyaha adhigayga. 2 Nimanka xooggoodu
dhammaaday Itaalka gacmahoodu muxuu ii tarayaa? 3
Waxay la weydoobeen baahi iyo abaar, Oo waxay u cararaan
dhul engegan, kaasoo ah lamadegaan gudcur iyo cidlo
ah. 4 Waxay gurtaan geed cusbeed oo kaynta ku yaal,
Oo cuntadooduna waxa weeye geed rotem la yidhaahdo
xididdadiisa. 5 Iyaga dadka waa laga dhex eryaa, Oo waxaa
looga daba qayliyaa sida tuug looga daba qayliyo oo kale.
6 Waa inay ku hoydaan haadaamaha dooxooyinka, Iyo
boholaha dhulka iyo dhagaxyada dhexdooda. 7 Waxay ka
qayliyaan kaynta dhexdeeda, Oo waxay dhammaantood ku
soo ururaan maraboob hoosteed. 8 Iyagu waa nacasyo iyo
ceebaalowyo carruurtood, Oo dhulka waxaa lagaga saaray
karbaash. 9 Oo haatan gabay cay ah baan u noqday, Oo
halqabsi baan u ahay. 10 Way i karahsadaan, oo meel fog
bay iga istaagaan, Oo inay candhuufo wejiga iiga tufaanna
iskama ay qabtaan. 11 Ilaah baa xadhiggaygii debciyey,
wuuna i dhibay, Oo taas aawadeed iyagu hortayda iskuma
celiyaan. 12 Xagga midigtayda waxaa ka kaca ciyaalasuuq,
Oo cagtaydana way iska riixaan, Oo waxay igu hor tuuraan
jidadkoodii halligaadda. 13 Jidadkayga way halleeyaan, Oo
waxay soo deddejiyaan masiibadayda; Oo mid caawiyaana
ma jiro. 14 Jabniin ballaadhan ayay ka soo dusaan, Oo
burburka dhexdiisa ayay igaga soo dhacaan. 15 Waxaa igu
soo jeesta cabsi weyn, Oo sharaftayda waxaa loo kaxeeyaa
sida dabayshu wax u kaxayso oo kale. Barwaaqadaydiina
waxay u dhammaatay sidii daruur oo kale. 16 Haddaba
naftaydaa igu dhex daadatay, Oo waxaan la kulmay wakhti
dhibaato badan. 17 Habeenkii lafahaygaa i muda, Oo
xanuunka i cunayaana ima daayo innaba. 18 Xoogga weyn
oo cudurkayga daraaddiis ayaa dharkaygii ku xumaaday, Oo
wuxuu iigu cidhiidhisan yahay sidii jubbaddayda qoorteeda.
19 Isagu wuxuu igu tuuray dhoobada dhexdeeda, Oo waxaan
noqday sidii boodh iyo dambas oo kale. 20 Anigu waan
kuu qayshadaa, adiguse iima aad jawaabtid, Waan ku soo
hor istaagaa, adiguse ima aad aragtid. 21 Calooladeeg
baad igula soo jeesatay, Oo gacantaada itaalkeeda ayaad
igu silcisaa. 22 Kor baad iigu qaaddaa dabaysha, Oo
waxaad i fuushisaa dusheeda, Oo haddana waxaad igu
baabbi'isaa duufaanka. 23 Waayo, waan ogahay inaad ii
kaxaynaysid dhimasho, Iyo guriga inta nool oo dhammu
ku wada kulmayaan. 24 Laakiinse ninkii hoos u dhacaya
sow gacantiisa sooma fidiyo? Markuu halligmayose sow ma
qayshado? 25 Oo ninka dhibaataysan anigu sow uma ooyi
jirin? Naftayduse sow masaakiinta uma murugoon jirin? 26
Laakiinse markaan wanaagga filanayo waxaa ii iman jiray
xumaanta, Oo markaan nuurka sugana waxaa ii iman jiray
gudcurka. 27 Qalbigaygu welwel buu la kacsan yahay, mana
nasto, Oo waxaan la kulmay wakhti dhibaato badan. 28
Anigoo barooranaya ayaan qorraxda la'aanteed socdaa,
Waxaan ka dhex istaagaa shirka, oo caawimaad waan u
qayshadaa. 29 Waxaan noqday walaalka dawacooyinka, Iyo
saaxiibka gorayada. 30 Dubkaygu intuu gubto ayuu iska
diirmaa, Oo lafahayguna kulayl bay ku gubtaan. 31 Sidaas
daraaddeed kataaradaydii waxay u rogmatay baroorasho,
Oo biibiilahaygiina wuxuu u rogmaday kuwa ooya codkooda.

**31** Waxaan axdi la dhigtay indhahayga, Haddaba bal
sidee baan gabadh u fiirinayaa? 2 Waayo, waa maxay

qaybta laga helo Ilaaha xagga sare jooga, Iyo dhaxalka
laga helo Ilaaha Qaadirka ah oo sarreeya? **3** Sow belaayo
uma aha kuwa xaqa daran, Iyo masiibo kuwa xumaanta ka
shaqeeya? **4** Isagu sow uma jeedin socodkayga oo dhan?
Oo sow ma tirinin tallaabooyinkayga oo dhan? **5** Haddaan
hawo been ah ku socday, Oo ay cagtaydu khiyaano u
dheeraysay, **6** (Ha laygu miisaamo miisaan siman, Si Ilaah
ku ogaado daacadnimadayda, ) **7** Haddii tallaabadaydu jidka
gees uga leexatay, Oo qalbigaygu uu indhahayga raacay,
Iyo haddii ay bar ceeb ahu gacmahayga ku dhegtay, **8**
Markaas anigu aan wax beero, oo mid kale ha cuno, Oo
xataa waxa beertayda ka soo baxa ha la wada rujiyo. **9**
Haddii qalbigayga ay naagu sasabatay, Oo aan albaabka
deriskayga ku ag dhuuntay, **10** Markaas naagtaydu nin kale
wax ha u shiiddo, Oo kuwa kale ha ku kor foororsadeen
iyada. **11** Waayo, kaasu waa dembi baas, Oo waa xumaan
ay xaakinnadu ciqaabi lahaayeen, **12** Waayo, kaasu waa dab
wax dhammeeya ilaa uu baabbi'iyo, Oo waxa ii soo baxa
oo dhan wuu wada rujin lahaa. **13** Haddaan addoonkayga
ama addoontayda dacwadooda quudhsaday, Markay ila
mudacayeen, **14** Haddaba bal maxaan samayn doonaa
markii Ilaah sara joogsado? Oo markuu i soo booqdose
bal maxaan ugu jawaabi doonaa? **15** Kii uurka dhexdiisa
igu abuuray sow isagana ma abuurin? Oo sow uurka
nalaguma dhex samayn? **16** Haddaan miskiin u diiday wax
uu doonayay, Ama aan indhaha carmalka illin ka keenay, **17**
Amase haddaan quudkayga keligay cunay, Oo ayan agoontu
wax ka cunin, **18** (Saas ma aha, laakiinse isaga tan iyo
yaraantaydii waan koriyey sidii mid aabbihiis koriyo oo kale,
Oo tan iyo markaan uurkii hooyaday ka soo baxayna waxaan
iyada u ahaan jiray horseed, ) **19** Haddaan arkay qof arrad
daraaddiis u dhimanaya, Amase sabool baahan oo aan dhar
haysan, **20** Hadduusan uurka iiga ducayn, Amase hadduusan
isku kululayn dhogorta idahayga, **21** Caawimaaddaydii
oo aan iridda uga jeeday daraaddeed, Haddaan agoon
gacantayda u qaaday, **22** Markaas garabkaygu ha kala
fakado, Oo gacantayduna kalagooyska ha ka jabto. **23**
Waayo, masiibo xag Ilaah ka timid ayaa i cabsiisay, Oo
sarraysnaantiisa daraaddeedna anigu waxba ma aanan
samayn karin. **24** Haddaan dahab rajo ka dhigtay, Oo aan
dahabka saafiga ah ku idhi, Kalsoonidayda baad tahay, **25**
Haddaan ku reyreeyey maalkayga badan daraaddiis, Iyo
waxyaalaha badan oo gacantaydu heshay daraaddood, **26**
Haddaan fiiriyey qorraxda oo dhalaalaysa, Ama dayaxa oo
iftiin ku socda, **27** Oo markaas qalbigayga haddii qarsoodi
loo sasabtay, Oo anoo caabudaya aan afkayga gacanta
ugu dhunkaday, **28** Kaasu weliba waa dembi ay xaakinnadii
ciqaabi lahaayeen, Waayo, waxaan daacadlaawe u ahaan
lahaa Ilaaha wax walba ka sarreeya. **29** Haddaan ku
reyreeyey kan i neceb halligaaddiisa, Ama aan aad u farxay
markii belaayadu isaga heshay, **30** (Afkayga uma aanan
oggolaan inuu ku dembaabo Naftiisa oo aan habaar u
weyddiisto; ) **31** Dadka teendhadayda jooga haddayan isku
odhan, Yaa heli kara mid aan hilibkiisa ka dhergin? **32**
Shisheeyuhu jidka kuma baryi jirin, Laakiinse socotada ayaan
albaabbadayda u furi jiray, **33** Haddaan xadgudubkaygii
daboolay sidii binu-aadmiga oo kale, Anigoo xumaantayda
laabtayda ku qarinaya, **34** Maxaa yeelay, dadka badan waan
ka baqay, Oo quudhsiga qaraabaday ayaa i cabsiiyey, Oo
saas aawadeed ayaan ku aamusay, oo dibadda uma bixin.
**35** Hoogaye haddaan lahaan lahaa mid i maqla! (Bal eeg,
waa tan calaamaddaydii, haddaba Ilaaha Qaadirka ahu ha
ii jawaabo; ) Yaa i siinaya eedayntii uu cadowgaygu iga
qoray! **36** Sida xaqiiqada ah garabkaygaan ku qaadan lahaa,
Oo weliba madaxaan ku xidhan lahaa sidii taaj oo kale. **37**
Oo waxaan isaga u sheegi lahaa tirada tallaabooyinkaygu
inta ay tahay; Oo waxaan isaga ugu soo dhowaan lahaa
sidii amiir oo kale. **38** Haddii dalkaygu uu iga qayliyo, Oo
jeexjeexiisu ay dhammaantood wada ooyaan, **39** Haddaan
midhihiisa lacagla'aan ku cunay, Ama aan sabab u noqday in
kuwii lahaa ay dhintaan, **40** Sarreenka meeshiisii yamaarug
ha ka soo baxo, Oo shiciirka meeshiisiina gocondho ha ka
soo baxdo. Ayuub erayadiisii way dhammaadeen.

**32** Markaasay saddexdaas nin iska daayeen inay Ayuub
u jawaabaan, maxaa yeelay, isagu xaq buu isla ahaa.
**2** Markaas waxaa cadhooday Eliihuu ina Barakeel oo ahaa
reer Buus oo qoladiisu ahayd reer Raam, oo aad buu Ayuub
ugu xanaaqay, maxaa yeelay, isagu xaq buu isu qaatay
intuu Ilaah xaq u qaadan lahaa. **3** Oo weliba wuxuu aad ugu
cadhooday saddexdiisii saaxiib, maxaa yeelay, iyagu jawaab
ma ay helin, ee weliba Ayuub way xukumeen. **4** Haddaba
Eliihuu inuu Ayuub la hadlo ayuu sugayay, maxaa yeelay,
iyagu isaga way ka waaweynaayeen. **5** Oo Eliihuu markuu
arkay inaan jawaab afka saddexdaas nin lagu arag ayuu aad
u cadhooday. **6** Oo Eliihuu ina Barakeel oo ahaa reer Buus
ayaa jawaabay oo wuxuu yidhi, Anigu waxaan ahay nin
dhallinyar, idinkuse odayaal baad tihiin, Sidaas daraaddeed
ayaan dib isugu celiyey, oo aan ugu dhici waayay inaan
ra'yigayga idiin caddeeyo. **7** Waxaan is-idhi, Waxaa roon
kuwa da'da waaweynu inay hadlaan, Kuwa cimriga dheeruna
inay xigmad na baraan. **8** Laakiinse binu-aadmiga ruux
baa ku jira, Oo Ilaaha Qaadirka ah neeftiisa ayaa iyaga
waxgarasho siisa. **9** Kuwa cimriga weynu ma aha kuwa

xigmadda leh, Odayaashuna ma aha kuwa garsooridda
garta. 10 Sidaas daraaddeed waxaan idin leeyahay, Bal i
dhegaysta; Aniguna ra'yigayga waan idiin caddaynayaa. 11
Bal eega, erayadiinnii waan sugayay, Oo xigmaddiinniina
waan dhegaysanayay, Intaad baadhbaadhayseen wixii
aad odhan lahaydeen. 12 Sida runta ah aad baan idiin
dhegaysanayay, Oo bal eega, laydinkuma arag mid Ayuub
rumaysiiyey, Amase mid erayadiisii uga jawaabay. 13 Isjira
inaydaan odhan, Annagu xigmad waannu helnay; Ilaah
baa isaga ka adkaan kara, laakiinse dadi ma kari karo. 14
Waayo, isagu erayadiisii iguma uu soo jeedin, Oo anigu
hadalladiinnii isaga ugu jawaabi maayo. 15 Iyagii way
yaabsan yihiin, oo mar dambena ma ay jawaabaan; Oo wax
ay ku yidhaahdaanna ma leh. 16 Haddaba anigu miyaan u
sii sugaa, hadalka ay waayeen daraaddiis, Iyo istaagiddooda
daraaddeed, oo ay mar dambe jawaabi waayeen? 17
Haddaba aniguna qaybtayda waan ka jawaabayaa, Oo
ra'yigaygana waan caddaynayaa. 18 Waayo, waxaa iga
buuxa erayo; Oo ruuxa gudahayga ku jira ayaa i qasba.
19 Bal eega, calooshaydu waa sidii khamri sibraar ku jirta
oo aan lahayn meelay ka neefsato, Xataa sidii sibraarro ku
dhow inay qarxaan. 20 Anigu waan hadli doonaa, si aan
u qalbi qabowsado; Oo bushimahayga waan kala qaadi
doonaa, waanan jawaabi doonaa. 21 Waan idin baryayaaye,
yaanan ninna u eexan, Oo weliba ninna u bixin maayo
magacyo faanid ah. 22 Waayo, anigu ma aan aqaan si loo
bixiyo magacyo faanid ah, Haddii kalese Kii i sameeyey
ayaa haddiiba i qaadi lahaa.

**33** Habase ahaatee, Ayuubow, waan ku baryayaaye,
hadalkayga maqal, Oo erayadayda oo dhanna dhegta
u dhig. 2 Bal eeg haatan, afkaygaan furay, Oo carrabkaygu
wuxuu ku dhex hadlay afkayga. 3 Erayadaydu waxay sheegi
doonaan qummanaanta qalbigayga, Oo bushimahayguna
wixii ay yaqaaniin si daacad ah ayay ugu hadli doonaan.
4 Waxaa i sameeyey Ruuxa Ilaah, Oo waxaa i noolaysa
Ilaaha Qaadirka ah neeftiisa. 5 Haddaba haddaad kartid ii
jawaab, Oo hortayda erayada si hagaagsan ugu sheeg oo
istaag. 6 Bal eeg, aniguba xag Ilaah waxaan ahay sidaada
oo kale; Oo anigana waxaa layga uumay dhoobo. 7 Bal
eeg, nixintaydu kuma cabsiin doonto, Oo gacantayduna
kuguma cuslaan doonto. 8 Sida xaqiiqada ah dhegahaygaad
ku hadashay, Waanan maqlay codkii erayadaada oo leh, 9
Anigu nadiif baan ahay, oo xadgudubna ma lihi, Xaq ma
qabo, oo xumaanuna iguma jirto innaba. 10 Bal eeg, sabab
uu igu eedeeyo ayuu iga helaa, Oo wuxuu igu tiriyaa inaan
cadowgiisa ahay; 11 Cagahayga wuxuu geliyaa jeebbooyin,
Oo jidadkayga oo dhanna wuu wada fiiriyaa. 12 Bal eeg,
waan kuu jawaabi doonaa, haddaba waxan xaq kuma tihid,
Waayo, Ilaah baa binu-aadmiga ka sii weyn. 13 Haddaba
maxaad isaga ula asaraartantaa? Waayo, isagu axwaalkiisa
midnaba jawaab kama baxsho. 14 Waayo, Ilaah wuxuu
hadlaa mar, Ama laba jeer, in kastoo aan laga fiirsanayn.
15 Riyada iyo muujinta habeennimo, Markii hurdo weynu
dadka ku soo degto, Oo sariirta lagu gam'o, 16 Markaasuu
dhegaha binu-aadmiga furaa, Oo waxa iyaga lagu waaniyey
ayuu xaqiijiyaa, 17 Si uu dadka uga soo celiyo qasdigooda
xun, Oo uu binu-aadmiga kibir uga qariyo, 18 Oo naftiisana
wuxuu dib uga hayaa yamayska, Oo noloshiisana wuxuu ka
hayaa seefta. 19 Oo weliba waxaa sariirtiisa lagu kor edbiyaa
xanuun, Iyo dagaal joogto ah oo lafihiisa ku dhex jira. 20
Sidaas daraaddeed nafsaddiisu kibista way karahsataa,
Naftiisuna cuntada macaan way nacdaa. 21 Hilibkiisu waa
ka mudhuxsan yahay, oo mar dambe lama arki karo; Oo
lafihiisii aan la arki jirinuna way soo baxaan. 22 Hubaal
naftiisu waxay ku dhow dahay yamayska, Oo noloshiisuna
waxay ku dhow dahay kuwii baabbi'in lahaa. 23 Hadday la
joogi lahayd malaa'ig dhexdhexaadeye ah Oo ah mid kun ka
mid ahu, Inay dadka tusto waxa ku qumman, 24 Markaas
Ilaah baa u naxariista, oo wuxuu leeyahay, Yamayska uu ku
sii dhacayo ka samatabbixi, Waayo, furasho baan helay.
25 Hilibkiisu waa ka sii jilicsanaan doonaa kan ilmaha; Oo
wuxuu ku noqdaa wakhtigii dhallinyaranimadiisa. 26 Isagu
Ilaah buu baryaa, oo isna raalli buu ka noqdaa, Sidaas
daraaddeed wejigiisa farxad buu ku arkaa; Oo wuxuu dadka
u soo celiyaa xaqnimadiisa. 27 Isagu dadka hortiisa buu
ku gabyaa, oo wuxuu leeyahay, Waan dembaabay, oo
waxaan qallooociyey wixii qummanaa, Oo taasuna layguma
abaalgudin. 28 Isagu naftayduu ka soo furtay yamayskii ay
ku dhacaysay, Oo noloshayduna iftiin bay arki doontaa. 29
Bal eeg, waxyaalahan oo dhan Ilaah baa binu-aadmiga ku
sameeya, Laba ama saddex jeer, 30 Si uu naftiisa yamayska
uga soo celiyo, In isaga lagu iftiimiyo iftiinka kuwa nool. 31
Ayuubow, i maqal oo aniga i dhegayso: Adigu iska aamus,
oo anna waan hadli doonaa. 32 Haddaad wax odhan lahayd,
ii jawaab, Oo hadal, waayo, waxaan jeclahay inaan xaq kaa
dhigo. 33 Haddii kalese, bal i dhegayso: Iska aamus, oo
anna xigmad baan ku bari doonaa.

**34** Oo weliba Eliihuu wuu jawaabay oo wuxuu yidhi, 2
Raggiinna xigmadda lahow, erayadayda maqla; Oo
kuwiinna aqoonta lahow, i dhegaysta. 3 Waayo, dhegtu
waxay hadalka u kala soocdaa Sida dhabxanaggu cuntada u
dhedhemiyo oo kale. 4 Aynu dooranno waxa qumman, Oo
aynu dhexdeenna ka ogaanno waxa wanaagsan. 5 Waayo,

Ayuub wuxuu yidhi, Anigu xaq baan ahay, Laakiinse Ilaah
baa gartaydii ii diiday. 6 Oo in kastoo aan xaq ahay haddana
waxaa laygu tiriyey inaan beenlow ahay; Oo in kastoo aanan
xadgudub lahayn, haddana nabarkaygu waa mid aan bogsan
karin. 7 Ninkee baa Ayuub la mid ah, Oo quudhsashada u
cabba sida biyaha oo kale, 8 kaasoo raaca kuwa xumaanta
ka shaqeeya, Oo dadka sharka ah la socda? 9 Waayo,
isagu wuxuu yidhi, Ninna wax uma tarto Inuu Ilaah ku
farxo. 10 Haddaba sidaas daraaddeed i dhegaysta, raggiinna
waxgaradka ahow; Ilaah inuu xaqdarro sameeyo way ka fog
tahay; Oo Ilaaha Qaadirka ahna inuu xumaan falo way ka fog
tahay. 11 Waayo, nin walba shuqulkiisuu ka abaalmariyaa,
Oo nin kastana siduu socodkiisu ahaa ayuu ugu abaalgudaa.
12 Laakiinse hubaal Ilaah xaqdarro ma uu samayn doono, Oo
Kan Qaadirka ahuna garta ma uu qalloocin doono. 13 Bal yaa
isaga ku amray inuu dhulka u taliyo? Yaase isaga dusha ka
saaray dunida oo dhan? 14 Hadduu keligiis iska fikiri lahaa,
Oo uu ruuxiisa iyo neeftiisa soo urursan lahaa, 15 Dadka
oo dhammu waa wada baabbi'i lahaa, Oo binu-aadmiguna
ciidduu ku noqon lahaa. 16 Haddaba haddaad waxgarad
tahay, waxan maqal; Oo erayadayda codkooda dhegayso.
17 War mid xaqnimada neceb miyuu wax u talinayaa? Oo ma
waxaad xukumaysaa midka xaqa ah oo xoogga badan? 18
Ma waxaa boqor lagu yidhaahdaa, Shar baad tahay? Amase
kuwa gobta ah, Cibaadalaawayaal baad tihiin? 19 Haddaba
ma saasaad ku odhan lahayd kan aan amiirrada u eexan,
Ama aan taajirka uga roonayn kan miskiinka ah? Waayo,
iyagu dhammaantood waa shuqulkii gacmihiisu sameeyeen.
20 Iyagu daqiiqad bay ku dhintaan, Dadku habeenbadhkiiba
way gariiraan oo naftaa ka baxda, Kuwa xoogga badanuna
way libdhaan iyadoo aan gacanna la saarin. 21 Waayo,
indhihiisu waxay fiiriyaan jidadka binu-aadmiga, Wuxuuna
wada arkaa socodkiisa oo dhan. 22 Ma jiro gudcur ama
hoosdhimasho toona Oo ay kuwa xumaanta sameeyaa ku
dhuuntaan. 23 Waayo, isagu uma baahna inuu in kale binu-
aadmiga ka sii fikiro, Inuu isagu Ilaah hortiisa garsoorid u
tago. 24 Ragga xoogga badan ayuu u kala jejebiyaa siyaalo
aan la baadhi karin, Oo meeshoodiina kuwa kaluu ka kiciyaa.
25 Maxaa yeelay, isagu shuqulladooda wuu yaqaan; Oo
habeennimuu afgembiyaa si ay u burburaan. 26 Sharkooda
daraaddiis ayuu iyaga wax ku dhuftaa, Iyagoo dadka kale
u jeedo, 27 Maxaa yeelay, lasocodkiisii way ka leexdeen,
Oo waxay diideen inay jidadkiisa midnaba ka fikiraan. 28
Sidaasay qaylada masaakiinta isaga soo gaadhsiiyeen,
Oo isna qaylada kuwa dhibaataysan ayuu maqlay. 29
Haddii quruun lagu sameeyo iyo haddii qof lagu sameeyaba,
Markuu nasiyo yaa belaayo kicin kara? Oo markuu wejigiisa
qariyana bal yaa isaga fiirin kara? 30 Inaan cibaadalaawe
boqornimada qabsan, Si uusan u jirin mid dadka shirqool u
dhiga. 31 Waayo, ninna miyuu Ilaah ku yidhi, Anigu edbintii
waan qaatay, oo mar dambe ninna xumayn maayo, 32
Haddaba waxaanan u jeedin i bar, Oo haddaan xumaan
sameeyeyna mar dambe u noqon maayo? 33 Abaalgudkiisu
ma wuxuu ahaan doonaa sidaad doonaysid, inaad diiddid
aawadeed? Waayo, waa inaad adigu doorataa, mana aha
aniga; Haddaba waxaad taqaanid ku hadal. 34 Nin kasta oo
xigmad leh oo i maqla iyo dadka waxgaradka ahuba Waxay
igu odhan doonaan, 35 Ayuub aqoonla'aan buu ku hadlaa,
Oo hadalkiisana xigmadu kuma jirto. 36 Waxaan jeclaan
lahaa in Ayuub tan iyo ugudambaysta la sii imtixaamo,
Maxaa yeelay, wuxuu u jawaabaa sida dadka sharka ah. 37
Waayo, dembigiisii wuxuu ku sii darsadaa caasinimo, Oo
dhexdeenna ayuu ka sacab tuntaa, Erayadiisana wuxuu ku
sii badiyaa Ilaah.

35 Oo weliba Eliihuu wuu sii jawaabay oo wuxuu yidhi,
2 Ma waxaad u malaynaysaa in taasu xaq tahay,
Amase ma waxaad leedahay, Xaqnimadaydu way ka sii
badan tahay tan Ilaah? 3 Miyey kugu habboon tahay inaad
tidhaahdid, Maxay ii taraysaa? Oo waa maxay faa'iidada
aan ka helayo oo ka sii badan haddaan dembaabay? 4
Haddaba waxaan u jawaabayaa Adiga iyo saaxiibbadaada
kula jiraba. 5 Bal indhahaaga kor u qaad oo samooyinka eeg,
Oo bal daruuraha kaa sarreeya fiiri. 6 Haddaad dembaabtay
maxaa xumaan ah oo aad yeeshaa? Oo xadgudubyadaadu
hadday bataanse maxaad isaga ku samaysaa? 7 Haddaad
xaq tahayse bal maxaad isaga siisaa? Isaguse muxuu
gacantaada ka helaa? 8 Xumaantaadu waxay wax u dhintaa
nin sidaadoo kale ah, Oo xaqnimadaaduna waxay wax ku
tartaa binu-aadmiga. 9 Dulmiga ku batay daraaddiis ayay u
qayliyaan, Oo kan xoogga badan gacantiisa daraaddeed
ayay caawimaad ugu qayshadaan. 10 Laakiinse ninna ma
yidhaahdo, Meeh Ilaahii i abuuray, Oo habeenkii gabayo i
siiya, 11 Oo wax na bara in ka sii badan xayawaanka dunida
jooga, Oo weliba naga sii xigmad badiya haadda samada
duusha? 12 Dadka sharka ah kibirkooda daraaddiis Ayay
iyagu halkaas uga qayliyaan, laakiinse ninna uma jawaabo.
13 Hubaal Ilaah maqli maayo wax aan waxba ahayn, Oo
Kan Qaadirka ahuna innaba ka fiirsan maayo. 14 In kastoo
aad tidhaahdaa, Isaga ma arko, Dacwadii isagay hor taal,
oo adna waa inaad isaga sugtaa. 15 Laakiinse haatan,
isagu cadhadiisii kuma uu soo booqan, Oo xumaantana si
weyn ugama uu fikiro; 16 Haddaba sidaas daraaddeed ayaa

Ayuub hadalka aan waxtarka lahayn afkiisa ugu furaa, Oo
isagoo aan aqoon lahayn ayuu erayo badiyaa.

**36** Oo weliba Eliihuu hadalkiisii buu watay oo wuxuu
yidhi, **2** Weliba in yar ii sii kaadi, oo anna wax baan
ku tusayaa, Waayo, weli waxaan hayaa wax aan Ilaah
daraaddiis u odhanayo. **3** Aqoontayda meel fog baan ka
keeni doonaa, Oo xaqnimana waan ka sheegi doonaa kii
i abuuray. **4** Waayo, sida runta ah erayadaydu been ma
aha; Oo mid aqoontu kaamil ku tahay ayaa kula jooga. **5**
Bal eeg, Ilaah waa xoog badan yahay, oo isagu ninna ma
quudhsado, Oo itaalka waxgarashada wuu ku xoog badan
yahay. **6** Isagu uma daayo kan sharka ahu inuu sii noolaado,
Laakiinse kuwa dhibaataysan xaqooduu siiyaa. **7** Isagu
indhihiisa kama qaado kuwa xaqa ah, Laakiinse wuxuu
weligoodba la fadhiisiyaa boqorrada carshiga ku fadhiya,
Oo iyaga waa la sarraysiiyaa. **8** Oo haddii silsilado lagu
xidho, Oo xadhkaha dhibka lagu kaxaysto, **9** Markaas wuxuu
iyaga ku caddeeyaa falimahooda, Iyo xadgudubyadoodii ay
kibirka u sameeyeen. **10** Oo dhegtoodana wuxuu u furaa
waxbaridda, Oo wuxuu ku amraa inay xumaanta ka soo
noqdaan. **11** Hadday isaga maqlaan oo ay u adeegaan,
Cimrigooda waxay ku dhammaysan doonaan barwaaqo,
Oo sannadahoodana waxay ku waari doonaan nimco. **12**
Laakiinse hadday maqli waayaan, seef bay ku baabbi'i
doonaan, Oo waxay dhiman doonaan iyagoo aan aqoon
lahayn. **13** Laakiinse kuwa cibaadalaawayaasha ah oo
qalbigoodu beloobay waxay isa soo gaadhsiiyaan cadho,
Oo markuu iyaga xidhana caawimaad uma qayshadaan.
**14** Dhallinyaranimay ku dhintaan, Oo naftooduna waxay ku
halligantaa khaniisiinta dhexdooda. **15** Isagu kii dhibban
ayuu dhibaatadiisa ku samatabbixiyaa, Oo dhegahana buu u
furaa markay dhib la kulmaan. **16** Isagu dhibaato wuu kaa
bixin lahaa, Oo wuxuu ku geeyn lahaa meel ballaadhan
oo aan cidhiidhi ahayn, Oo miiskaaga waxa saaran oo
dhammuna waxay ahaan lahaayeen baruur miidhan. **17**
Laakiinse xukunka kuwa sharka ah ayaa kaa buuxa, Oo
garsoorid iyo caddaalad ayaa ku qabsada. **18** Iska jir yaanay
cadho ku sasabin si aad wax u majaajilootid, Oo furashada
weynaanteeduna yaanay ku leexin. **19** Taajirnimadaada iyo
xoogga itaalkaaga oo dhammu Miyey kugu filan yihiin inay
dhibaato kaa saaraan? **20** Habeenka ha doonin, Markay
dadyowgu meeshooda ku wada baabba'aan. **21** Iska jir oo
xumaan ha u jeedin, Waayo, taasaad ka dooratay dhibaato.
**22** Bal eeg, Ilaah baa xooggiisa ku sarreeya; Waa ayo
macallinka isaga la mid ahu? **23** Jidkiisa yaa u amray? Yaase
isaga ku odhan kara, Waxaad samaysay xaqdarro? **24**
Xusuuso inaad weynaysid shuqulkiisii Ay dadku ka gabyeen.
**25** Dadka oo dhammu way wada fiiriyeen, Oo binu-aadmiguna
meel fog buu ka arkaa. **26** Bal eeg, Ilaah waa weyn yahay,
oo annana isaga ma aannu naqaan; Oo cimrigiisu intuu
yahayna lama soo baadhi karo. **27** Waayo, isagu wuxuu kor
u jiitaa dhibicyaha biyaha, Oo wuxuu ka dhigaa ceeryaamo
roob noqota, **28** Oo daruuraha ka soo da'a, Oo binu-aadmiga
aad ugu dul shubma. **29** Ninna miyuu garan karaa daruuraha
kala faafintooda, Iyo onkodyada taambuuggiisa? **30** Bal eeg,
isagu hareerihiisa wuxuu ku faafiyaa nuurkiisa, Oo badda
salkeedana wuu daboolaa. **31** Waayo, isagu kuwaasuu
dadyowga ku xukumaa, Oo cunto badanna wuu siiyaa. **32**
Gacmihiisuu hillaac ku daboolaa, Oo wuxuu ku amraa inuu
ku dhaco calaamadda uu ku liishaamay. **33** Sanqadhiisu
isagay wax ka sheegtaa, Oo weliba xayawaankuna wax bay
ka sheegaan waxa soo socda.

**37** Oo weliba taas aawadeed qalbigaygu wuu gariiraa, Oo
meeshiisiina wuu ka dhaqaaqaa. **2** Haddaba dhegaysta
qaylada codkiisa Iyo sanqadha afkiisa ka baxaysa. **3**
Wuxuu taas u diraa inta samada ka hoosaysa oo dhan,
Oo hillaaciisana wuxuu u diraa dhulka darfihiisa oo dhan.
**4** Dabadiisna wax baa aad uga sanqadha, Isagu wuxuu
ku onkodaa haybaddiisa codkeeda; Oo markii codkiisa la
maqlona iyaga ma uu joojiyo. **5** Ilaah si yaab ah ayuu
codkiisa ugu onkodaa, Oo wuxuu sameeyaa waxyaalo
waaweyn oo aynan garan karin. **6** Waayo, wuxuu barafka
cad ku yidhaahdaa, Dhulka ku da'; Oo sidaasoo kaluu
ku yidhaahdaa roobka yar Iyo roobkiisa weynba. **7** Isagu
wuxuu shaabadeeyaa nin kasta gacantiisa, In nin kasta oo
uu sameeyeyba ogaado. **8** Markaasaa bahalladu hogag
galaan, Oo waxay iska joogaan boholahooda. **9** Koonfurta
waxaa ka soo baxa duufaanka, Oo qabowguna wuxuu ka
yimaadaa woqooyiga. **10** Barafku wuxuu ku yimaadaa Ilaah
neeftiisa, Oo biyaha ballaadhanuna way barafoobaan. **11**
Daruurta qarada weyn ayuu ka buuxiyaa qoyaan, Oo wuxuu
kala firdhiyaa daruurta hillaaciisa, **12** Oo waxaa lagu soo
wareejiyaa hoggaamintiisa, Inay sameeyaan wax alla wixii
uu kugu amro Dunida la dego dusheeda oo dhan, **13** Hadday
tahay hagaajin aawadeed, ama dalkiisa aawadiis, Ama
naxariis aawadeed, kolleyba wuxuu ka dhigay inay kuwaasu
noqdaan. **14** Ayuubow, bal tan dhegayso, Istaag oo bal ka
fiirso shuqullada Ilaah oo yaabka miidhan ah. **15** War miyaad
taqaan siduu iyaga u amro, Iyo siduu hillaaca daruurtiisa u
iftiimiyo? **16** Miyaad taqaan miisaaminta daruuraha, Amase
kan aqoontu kaamilka ku tahay shuqulladiisa yaabka leh? **17**
Miyaad taqaan wuxuu dharkaagu u kulul yahay, Markuu Ilaah

dhulka ku xasilliyo dabaysha koonfureed? 18 Miyaad isaga
la kala bixin kartaa cirka U xoogga badan sidii muraayad la
shubay? 19 Na bar wixii aan isaga ku odhan lahayn, Waayo,
annagu hadalkayagii waxaannu la odhan kari waynay gudcur
aawadiis. 20 Isaga ma loo sheegi doonaa inaan hadli doono?
Ninse miyuu jecel yahay in isaga la liqo? 21 Oo hadda
dadku ma fiirin karo iftiinka cirka ka dhalaalaya, Laakiinse
dabayshu waa soo gudubtaa, oo iyagay safaysaa. 22
Woqooyi waxaa ka soo baxa iftiin sida dahab u dhalaalaya,
Ilaahna wuxuu leeyahay haybad cabsi badan. 23 Annagu ma
heli karno Ilaaha Qaadirka ah, waayo, isagu wuu xoog badan
yahay; Oo isagoo garsoorid iyo caddaalad ka buuxa ninna
ma uu dhibi doono. 24 Sidaas daraaddeed dadku isagay
ka cabsadaan; Oo isagu ma uu fiiriyo kuwa qalbigooda
xigmaddu ka buuxdo.

**38** Markaasaa Rabbigu Ayuub uga jawaabay dabaysha
cirwareenta ah, oo wuxuu ku yidhi, 2 Waa kuma kan
talada ku madoobeeya Erayada aan aqoonta lahayn? 3
Haddaba sida nin rag ah dhexda u gunto, Waayo, wax
baan ku weyddiinayaa, oo adna waa inaad ii sheegtaa. 4
Markaan dunida aasaaskeeda dhigay xaggee baad joogtay?
Haddaad waxgarad tahay, taas ii sheeg. 5 Haddaadse
taqaanid yaa qiyaasteeda amray? Amase yaa xadhiggii
lagu qiyaasay ku kor fidiyey? 6 Aasaaskeedase bal xaggee
baa lagu dejiyey? Amase yaa dhigay dhagaxa geeska ah
7 Markay xiddigaha aroorya isla wada heeseen, Oo ay
carruurta Ilaah oo dhammu farxad la qayliyeen? 8 Amase
yaa badda albaabbo ku xidhay markay u soo faruurantay
Sidii wax maxal ka soo baxay, 9 Iyo markaan daruurta
dharka uga dhigay, Oo aan gudcurka maro lagu duudduubo
uga dhigay, 10 Oo aan hareeraheeda xad u amray, Oo aan
u yeelay qataarro iyo albaabbo, 11 Oo aan ku idhi, Ilaa
halkan soo gaadh, laakiinse innaba ha soo dhaafin, Oo
hirarkaaga kibirka lahu waa inay halkan ku joogsadaan? 12
Tan iyo waagii aad dhalatay marna subaxda ma amartay?
Waaberigase ma meeshiisaad ogeysiisay, 13 Si uu u
qabsado dhulka darfihiisa, Oo sharrowyada looga hurgufo?
14 Waa loo beddelaa sidii dhoobo shaabad ka hoosaysa,
Oo wax kastaaba waxay kor uga muuqdaan sidii dhar oo
kale, 15 Oo sharrowyadana iftiinkooda waa loo diiday, Oo
gacantii sarraysayna waa la jebiyey. 16 Adigu miyaad badda
ilaheeda dhex gashay? Miyaadse moolka salkiisa martay? 17
Geerida irdaheeda miyaa laguu muujiyey? Miyaadse aragtay
irdaha hooska dhimashada? 18 Miyaad garanaysaa dhulka
ballaadhkiisa? Haddaad waxaas wada taqaanid ii sheeg. 19
Rugta iftiinka jidka loo maraa waa xaggee? Gudcurkase
meeshiisu waa xaggee, 20 Si aad soohdintiisa u martid,
Oo aad u garatid wadiiqooyinka gurigiisa loo maro? 21
Shakila'aan waad taqaan, waayo, adigu wakhtigaas waad
dhalanayd Oo cimrigaaguna wuu dheer yahay! 22 Adigu
miyaad dhex gashay meesha barafka cad lagu kaydiyo?
Miyaadse aragtay meesha roobdhagaxyaalaha la dhigo,
23 Kuwaasoo aan u kaydsaday wakhtiga dhibaatada, Iyo
maalinta dirirta iyo dagaalka? 24 Iftiinka jidkee baa lagu kala
qaybiyaa? Dabaysha barise sidee baa dhulka loogu kor
firdhiyaa? 25 Bal yaa jid u sameeyey biyaha daadka ah,
Amase hillaaca onkodka, 26 Si roob ugu da'o dhul aan binu-
aadmina joogin, Iyo cidlada aan ninna degganayn, 27 Si uu
u dherjiyo dhulka cidlo iyo baabba' ah, Oo uu doog jilicsan
uga soo bixiyo? 28 Roobku ma aabbuu leeyahay? Yaase
dhalay dhibicyaha sayaxa? 29 Barafkuse bal yuu maxalkiisa
ka soo baxay? Yaase dhalay sayaxa barafoobay ee cirka ka
yimaada? 30 Biyihii waxay u adkaadeen sidii dhagax oo kale,
Oo moolka korkiisiina wuu barafoobay. 31 Adigu miyaad xidhi
kartaa ururka xiddigaha ee Toddobaadyada la yidhaahdo?
Miyaadse furi kartaa ururka Oriyon la yidhaahdo? 32 Miyaad
kartaa inaad xiddigaha Masarood la yidhaahdo xilligooda soo
saarto? Miyaadse ururka xiddigaha ee Orsada la yidhaahdo
carruurtiisa la kaxayn kartaa? 33 Miyaad taqaan amarrada
samooyinka? Dowladnimadoodana ma dhulkaad ku dhisi
kartaa? 34 Codkaaga miyaad daruuraha kor ugu qaadi
kartaa, Si biyo badanu ay kuu daboolaan daraaddeed? 35
Miyaad hillaaca diri kartaa, si ay u tagaan, Oo ay kuugu
yidhaahdaan, Waa na kan? 36 Bal yaa qalbiga xigmadda
geliyey? Yaase maanka waxgarashada siiyey? 37 Bal yaa
daruuraha xigmad ku tirin kara? Yaase qarbeddada samada
biyo ka shubi kara, 38 Markii boodhku taallooyin noqdo, Oo
ciidduna ay isku dhegto? 39 Miyaad karaysaa inaad gool
libaax u ugaadhid? Miyaadse dhal libaax dherjin kartaa,
40 Markay boholahooda ku dhex dhuuntaan, Oo ay hogga
u joogaan inay wax gaadaan? 41 Bal yaa tukaha cunto
ku quudiya, Markii dhashiisu Ilaah u qayshadaan, Oo ay
cuntola'aan daraaddeed u warwareegaan?

**39** War miyaad taqaan markay ri'dibadeedda qarka joogta
dhasho? Miyaadse arki kartaa markay deerooyinku
dhalaan? 2 Miyaad tirin kartaa bilaha sidkoodu ku buuxsamo?
Miyaadse taqaan wakhtiga ay dhalaan? 3 Intay arruntaan
ayay ubadkooda dhalaan, Oo fooshoodana way iska saaraan.
4 Oo ubadkooda yaryaruna way kobcaan, oo waxay ku
koraan berrin bannaan, Oo intay baxaan ayaanay mar
dambe soo noqon. 5 Bal yaa dameerdibadeedka xoreeyey?
Yaase dameerdibadeedka xadhkihiisii ka furay? 6 Kaas
gurigiisa waxaan ka dhigay cidlada, Oo rugtiisuna waa dalka

cusbada. 7 Magaalada buuqeeda wuu quudhsadaa, Oo
kexeeyaha qayladiisana ma maqlo. 8 Xidhiidhka buurahu
waa daaqiisa, Oo wuxuu raadiyaa wax kasta oo cagaar
ah. 9 Dibidibadeedku miyuu raalli ku noqon doonaa inuu
kuu adeego? Miyuuse qabaalka xeradaada ku ag hoyan
doonaa? 10 Dibidibadeedka miyaad xadhko ku xidhi kartaa si
uu beerta u qodo? Miyuuse dooxooyinka kaa daba hagaajin?
11 Xooggiisa badan daraaddiis miyaad isugu hallaynaysaa?
Hawshaadase ma isagaad u daynaysaa? 12 Ma waxaad
isaga ugu kalsoon tahay inuu midhahaaga guriga keeno, Oo
uu kuu soo urursho hadhuudhka goobkaaga wax lagu tumo?
13 Gorayada garabkeedu farxad buu la ruxmadaa, Laakiinse
garbaheeda iyo baalasheedu ma wax bay u roon yihiin?
14 Waayo, iyadu ugaxdeeda waxay kaga tagtaa dhulka
dushiisa, Oo ciidday ku diirisaa, 15 Oo waxay illowdaa inay
cagtu burburinayso, Iyo inuu dugaaggu ku tumanayo. 16
Waxay ku adkaataa dhasheeda, sidii iyagoo aan kuweedii
ahayn, Oo in kastoo ay waxtarla'aan u hawshooto haddana
iyadu cabsi ma qabto, 17 Maxaa yeelay, Ilaah baa iyada
xigmad u diiday, Oo waxgarashona ma uu siin. 18 Oo markay
kor isu qaaddo inay carartona, Waxay quudhsataa faraska
iyo kii fuushanba. 19 War ma adigaa faraska xooggiisa
siiyey? Surkiisase ma adigaa guudka ruxma huwiyey?
20 War ma adigaa ka dhigay inuu sida ayaxa u boodo?
Haybadda bururufta sankiisu way cabsi badan tahay. 21
Dooxaduu qoobka ku garaacaa, oo xooggiisuu ku reyreeyaa,
Oo intuu baxo ayuu ka hor tagaa ragga hubka sita. 22
Cabsida wuu ku qoslaa, oo ma uu baqo, Oo seeftana dib
ugama noqdo. 23 Korkiisa waxaa ka sanqadha gabooye,
Iyo waran birbirqaya iyo hoto. 24 Isagu dhulkuu ku liqaa
gariir iyo cadho, Oo buunka codkiisa hadduu maqlona ma
istaago. 25 Oo mar alla markii buunku dhawaaqo ayuu
"Haw" yidhaahdaa, Oo meel fog ayuu dagaalka ka uriyaa,
Wuxuuna maqlaa saraakiisha qayladooda onkodaysa iyo
hugunka. 26 Haadka adagu ma xigmaddaaduu kor ugu
duulaa? Garbihiisase xagga koonfureed ma u fidiyaa? 27
Baqalyaduse ma amarkaagay kor ugu duushaa? Oo ma
saasay buulkeeda meelaha sarsare uga dhisataa? 28 Waxay
ku hoyataa qarka dheer korkiisa, oo hoygeeduna halkaasuu
ku yaal, Xagga qarka dheer dhaladiisa, iyo meesha adag
dusheeda. 29 Oo iyadoo halkaas joogta ayay ugaadh ka
fiirsataa, Oo indhaheeduna meel fog bay wax ka arkaan. 30
Dhasheeda yaryaru dhiig bay nuugaan, Oo iyana waxay
joogtaa hadba meeshii raqu taal.

40 Oo weliba Rabbigu Ayuub buu u jawaabay oo wuxuu
ku yidhi, 2 Kii murmayaa ma Ilaaha Qaadirka ah buu
la diriri karaa? Kii Ilaah la doodayaa ha ka jawaabo taas. 3
Markaasaa Ayuub Rabbiga u jawaabay oo wuxuu ku yidhi, 4
Bal eeg, wax yar baan ahay, haddaba bal maxaan kuugu
jawaabaa? Afkaan gacanta saarayaa. 5 Mar baan hadlay,
jawaab dambena u noqon maayo, Laba jeer oo qudha ayaan
hadlay, laakiinse hadda ka dib sii wadi maayo. 6 Markaasaa
Rabbigu Ayuub uga dhex jawaabay dabaysha cirwareenta
ah, oo wuxuu ku yidhi, 7 Haddaba sidii nin rag ah dhexda u
gunto, Waayo, wax baan ku weyddiinayaa, oo adna waa
inaad ii sheegtaa. 8 War ma xukunkaygaad burinaysaa? Oo
ma waxaad ii xukumaysaa inaad xaq noqotid? 9 Adiguse ma
waxaad leedahay Ilaah gacantiisa oo kale? Oo codkiisa oo
kale miyaad ku onkodi kartaa? 10 Haddaba waxaad isku
sharraxdaa sarraysnaan iyo derejo, Oo waxaad huwataa
sharaf iyo haybad. 11 Haddaba cadhadaada buuxdhaafkeeda
soo daadi, Oo waxaad fiirisaa mid kasta oo kibir leh, oo
isaga hoos u soo deji. 12 Mid kasta oo kibir leh soo fiiri oo
hoosaysii, Oo kuwa sharka ah meel alla meeshay istaagaan
ku joogso. 13 Dhammaantood ciidda ku qari, Oo wejigoodana
meel qarsoon ku xidh. 14 Oo anna markaas waxaan kuu
qiran doonaa In gacantaada midig ay ku badbaadin karto.
15 Haddaba bal eeg jeerta aan u sameeyey sidaan kuu
sameeyey oo kale, Cawska bay u daaqdaa sida dibi oo kale.
16 Haddaba bal eeg, xooggeedu wuxuu ugu jiraa dhexdeeda,
Oo itaalkeeduna wuxuu ku jiraa muruqyada caloosheeda. 17
Oo dabadeedana waxay u taagtaa sida geed kedar ah oo
kale, Oo seedaha bowdooyinkeeduna way isku wada tidcan
yihiin. 18 Oo lafaheeduna waa sidii tuubbooyin naxaas ah;
Oo addimmadeeduna waa sidii wax bir ah. 19 Iyadu jidadka
Ilaah waa u madax, Oo kii abuuray oo keliya ayaa seeftiisa u
dhowayn kara. 20 Sida xaqiiqada ah waxaa iyada cunto u
soo bixiya Buuraha ay xayawaanka duurka oo dhammu ku
cayaaraan. 21 Oo waxay hoos jiifsataa dhirta hooska badan,
Iyo meesha qarsoon ee cawsduurka iyo biyagaleenka. 22
Dhirta hooska badan ayaa hadhkooda ku qariya, Oo waxaa
iyada ku wareegsan geedaha safsaafka ah ee durdurka ku
ag yaal. 23 Bal eeg, haddii webigu buuxdhaafo iyadu ma
gariirto, In kastoo Webi Urdun afka ka galo, haddana iyadu
way isku kalsoon tahay. 24 Ninna miyuu iyada qaban karaa
iyadoo u jeedda? Miyaase sanka dabin lagaga duleelin
karaa?

41 War bahalbadeedka Lewiiyaataan la yidhaahdo miyaad
jillaab kalluun ku soo bixin kartaa? Carrabkiisase ma
hoos baad xadhig ugu adkayn kartaa? 2 Ma sankiisaad
xadhig ku xidhi kartaa? Mase daankiisaad jillaab ku duleelin
kartaa? 3 Isagu ma aad buu kuu baryi doonaa? Mase hadal

macaan buu kugula hadli doonaa? 4 Ma axdi buu kula
dhigan doonaa, Si aad addoon uga dhigatid weligiisba? 5
Ma waxaad isaga ula cayaari doontaa sidaad shimbir ula
cayaartid oo kale? Miyaadse gabdhahaaga u xidhi doontaa?
6 Kalluumaystayaashu miyey isaga iibin doonaan? Mase
baayacmushtariyaasha bay u qaybin doonaan? 7 Haraggiisa
miyaad hotooyin ka buuxin kartaa? Madaxiisase miyaad
warmaha kalluunka lagu qabsado ka buuxin kartaa? 8
Gacantaada isaga kor saar, Markaas dagaalka xusuuso, oo
mar dambe saas yeeli maysid! 9 Bal eeg, in isaga la qabto
rajo ma leh, Xataa haddii isaga la arko, sow hoos loo dhici
maayo? 10 Ma jiro mid ku dhaca inuu isaga kiciyo, Haddaba
waa ayo kan aniga i hor istaagi kara? 11 Bal yaa hore wax ii
siiyey oo aan haatan u celiyaa? Waxa samada ka hooseeya
oo dhan anigaa leh. 12 Anigu ka aamusi maayo waxa ku
saabsan addimmadiisa, Ama itaalkiisa xoogga leh, ama
jidhkiisa quruxda badan. 13 Haddaba bal yaa dharkiisa kore
ka furan kara? Oo bal yaa gowsihiisa soo geli kara? 14 Bal
yaa albaabbada wejigiisa furi kara? Ilkihiisa aad baa looga
cabsadaa. 15 Qolfihiisa adag waa wuxuu ku kibro, Oo waxay
isugu wada xidhan yihiin sida wax shaabad lagu adkeeyo.
16 Midba midda kale way ku dhow dahay, Oo innaba dabaylu
dhexdooda kama dusi karto. 17 Middoodba midda kale way
haysataa, Oo way isku wada dheggan yihiin, oo innaba
lama kala fujin karo. 18 Hindhisooyinkiisa waxaa ka soo
widhwidha iftiin, Oo indhihiisuna waa sidii kaaha waaberiga.
19 Afkiisa waxaa ka soo baxa wax ololaya, Oo waxaa ka
soo duula dhimbiilo dab ah. 20 Dulalka sankiisa qiiq baa
ka soo baxa Sida dheri karaya iyo cawsduur ololaya. 21
Neeftiisu dhuxulay shiddaa, Oo olol baa afkiisa ka soo baxa.
22 Luquntiisu xoog bay leedahay, Oo cabsina hortiisay ku
booddaa. 23 Duudduubyada jidhkiisu way isku wada dheggan
yihiin, Wayna ku adag yihiin oo innaba lama dhaqaajin
karo. 24 Qalbigiisu wuxuu u adag yahay sida dhagax oo
kale, Hubaal wuxuu u adag yahay sida dhagaxa shiidka ee
hoose. 25 Markuu sara joogsado ayay kuwa xoogga badanu
baqaan, Oo naxdin daraaddeed ayay la waashaan. 26 In
kastoo lagula kaco seef, Iyo waran, iyo fallaadh, iyo hoto,
kolleyba waxba kama tari karaan. 27 Isagu birta wuxuu ku
tiriyaa sida caws engegan oo kale, Naxaastana wuxuu ku
tiriyaa sida qori bololay. 28 Fallaadhu isaga ma eryi karto, Oo
dhagaxyada wadhafkuna waxay isaga u noqdaan sidii xaab
oo kale. 29 Budhadhkuna waxay isaga la yihiin sidii xaab
oo kale, Oo hotada ruxmashadeedana wuu ku qoslaa. 30
Boggiisa hoose waa sida dheryo burburradooda afaysan, Oo
wuxuu dhoobada ugu kor dhaqaaqaa sida gaadhi hadhuudh
lagu tumo. 31 Isagu moolkuu u kariyaa sidii dheri oo kale,
Oo baddana wuxuu ka dhigaa sida weel cadar ku jiro oo
kale. 32 Xaggiisa dambe wuxuu noqdaa jid wax ka iftiimo,
Oo moolkana waxaa loo maleeyaa sidii cirro oo kale. 33
Dhulka ma joogo mid sidiisa oo kale, Oo cabsila'aan la
abuuray. 34 Isagu wuxuu fiiriyaa waxyaalaha sare oo dhan,
Oo inta kibirsan oo dhan boqor buu u yahay.

**42** Markaasaa Ayuub Rabbiga u jawaabay oo wuxuu ku
yidhi, 2 Waan ogahay inaad wax walba kartid, Iyo inaan
qasdigaaga innaba la joojin karin. 3 Bal waa ayo kan aan
aqoonta lahayn oo talada qariyaa? Haddaba anigu waxaan
ku hadlay wax aanan garanayn, Oo ah waxyaalo aad iiga
yaabiyey oo aanan innaba aqoon. 4 Waan ku baryayaaye i
maqal aan kula hadlee, Oo wax baan ku weyddiinayaaye ii
sheeg. 5 Markii hore ayaan wax kugu saabsan dhegaha ku
maqlay, Laakiinse haatan indhahaan kugu arkayaa, 6 Sidaas
daraaddeed waan isnacayaa, Waanan toobadkeenayaa
anigoo boodh iyo dambas ku fadhiya. 7 Oo markii Rabbigu
erayadaas Ayuub kula hadlay dabadeed wuxuu Eliifas oo
reer Teemaan ahaa ku yidhi, Cadhadaydii baa ku kululaatay
adiga iyo labadaadii saaxiibba, waayo, idinku wixii xaqa
ahaa igama aydaan sheegin, sidii addoonkayga Ayuub uu
yeelay oo kale. 8 Haddaba sidaas daraaddeed waxaad
soo wadataan toddoba dibi iyo toddoba wan, oo waxaad
u tagtaan addoonkayga Ayuub, oo waxaad nafsaddiinna
daraaddeed u bixisaan qurbaan la gubo; oo addoonkayga
Ayuub wuu idiin ducaynayaa, waayo, isagaan ka aqbalayaa,
si aanan idinkula macaamiloon sidii nacasnimadiinnii ahayd,
waayo, idinku wixii xaqa ahaa igama aydaan sheegin
sidii addoonkayga Ayuub uu yeelay oo kale. 9 Sidaas
daraaddeed Eliifas oo ahaa reer Teemaan, iyo Bildad oo
ahaa reer Shuuxii, iyo Soofar oo ahaa reer Nacamaatii way
tageen oo waxay u sameeyeen sidii Rabbigu ku amray, oo
Rabbiguna Ayuub wuu aqbalay. 10 Rabbiga ayaa Ayuub
axwaalkiisii beddelay markuu saaxiibbadiis u duceeyey;
oo Rabbiguna Ayuub wuxuu siiyey wixii uu markii hore
lahaa laba jibbaarkood. 11 Markaasaa Ayuub waxaa u yimid
walaalihiis oo dhan, wiilal iyo gabdhoba, iyo kuwii isaga hore
u yiqiin oo dhan, oo gurigiisii ayay kibis kula cuneen, wayna
u tacsiyeeyeen, oo waxay uga qalbi qaboojiyeen masiibadii
Rabbigu isaga ku soo dejiyey oo dhan. Oo nin kastaaba
wuxuu isagii siiyey in lacag ah iyo hilqad dahab ah. 12 Oo
sidaasuu Rabbigu Ayuub ugudambaystiisii u barakeeyey in
ka sii badan bilowgiisii hore; oo wuxuu lahaa afar iyo toban
kun oo ido ah, iyo lix kun oo geel ah, iyo laba kun oo dibi,
iyo kun dameerood. 13 Oo weliba wuxuu lahaa toddoba wiil
iyo saddex gabdhood. 14 Oo middii kowaad magaceedii

wuxuu u bixiyey Yemiimaah, tii labaad magaceediina wuxuu
u bixiyey Qasicaah, tii saddexaad magaceediina wuxuu
u bixiyey Qeren Hafuug. 15 Oo waddankaas oo dhanna
laguma arag dumar u qurxoon sida gabdhaha Ayuub, oo
aabbahoodna dhaxal buu walaalahood la siiyey. 16 Oo
wakhtigaas dabadeed Ayuub wuxuu noolaa boqol iyo afartan
sannadood, oo wuxuu arkay wiilashiisii, iyo wiilashiisa
wiilashoodiiba, tan iyo intii afar fac ah. 17 Markaasaa Ayuub
dhintay isagoo duq ah oo cimri weyn.

# Sabuurradii

1 Waxaa barakaysan ninkii aan ku socon talada kuwa
sharka leh, Oo aan istaagin jidka dembilayaasha, Oo
aan ku fadhiisan kursiga kuwa wax quudhsada. 2 Laakiinse
waxaa isaga ka farxiya sharciga Rabbiga, Oo habeen iyo
maalinba sharcigiisuu ka fikiraa. 3 Oo wuxuu ahaan doonaa
sida geed lagu beeray durdurrada biyaha agtooda, Oo
midhihiisa dhala xilligooda, Oo aan caleentiisuna engegin.
Oo wax alla wuxuu sameeyoba wuu ku liibaani doonaa.
4 Laakiinse kuwa sharka lahu sidaas ma aha, Iyaguse
waxay la mid yihiin buunshaha dabayshu kaxayso. 5 Sidaas
daraaddeed kuwa sharka lahu isma dhex taagi doonaan
xukunka, Dembilayaashuna sooma dhex geli doonaan kuwa
xaqa ah ururkooda. 6 Waayo, Rabbigu waa yaqaan kuwa
xaqa ah jidkooda, Laakiinse kuwa sharka ah jidkoodu waa
baabbi'i doonaa.

2 Bal quruumuhu maxay u cadhoodaan, Dadkuna maxay
ugu fikiraan wax aan waxba ahayn? 2 Boqorrada
dhulku col bay u taagan yihiin, Taliyayaashuna waxay u
wada tashadaan Rabbiga iyo Masiixiisa, iyagoo leh, 3
Silsiladahooda aan gooyno Oo xadhkahoodana aan iska
fogayno. 4 Kan samada fadhiyaa wuu qosli doonaa, Oo
Sayidku iyaga wuu ku majaajiloon doonaa. 5 Markaasuu
isagoo cadhaysan iyaga la hadli doonaa, Oo wuxuu iyaga
ku dhibi doonaa dhirifkiisa isagoo leh, 6 Anigu boqorkaygii
waxaan fadhiisiyey Buurtayda quduuska ah oo Siyoon. 7
Amarkii ayaan wax ka sheegi doonaa, Rabbigu wuxuu igu
yidhi, Adigu waxaad tahay wiilkayga, Maantaan ku dhalay. 8
I bari oo waxaan dhaxal ahaan kuu siin doonaa quruumaha,
Oo dunida meelaha ugu fogfogna hanti ahaan baan kuu siin
doonaa. 9 Waxaad iyaga ku jejebin doontaa ul bir ah, Oo
waxaad u burburin doontaa sida weelka dheryasameeyaha.
10 Haddaba sidaas daraaddeed, Boqorradow, caqli yeesha,
Oo xaakinnada dhulkow, edeb yeesha. 11 Rabbiga cabsi
ugu adeega, Oo reyreeya idinkoo gariiraya. 12 Wiilka
dhunkada, waaba intaasoo uu idiin cadhoodaa oo aad jidka
ku baabba'daane. Waayo, cadhadiisu haddiiba way kululaan
doontaa. Waxaa barakaysan kuwa isaga isku halleeya oo
dhan.

3 Rabbiyow, cadaawayaashaydu fara badanaa! Kuwa igu
kacaa aad bay u badan yihiin. 2 Way badan yihiin kuwa
naftayda wax ka sheegaa, iyagoo leh, Ilaah isaga caawin
maayo. (Selaah) 3 Laakiinse, Rabbiyow, adigu waxaad
tahay gaashaan igu wareegsan, Iyo sharaftayda, iyo kan
madaxayga kor u qaada. 4 Codkayga ayaan Rabbiga
ugu qayliyaa, Oo isaguna wuxuu iiga jawaabaa buurtiisa
quduuska ah. (Selaah) 5 Anigu waan jiifsaday oo waan iska
seexday, Oo haddana waan soo toosay, waayo, Rabbiga
ayaa i xannaaneeya. 6 Ka baqi maayo dadka kumanyaalkaa,
Oo gees kasta iga hareereeyey. 7 Kac, Rabbiyow, oo
i badbaadi, Ilaahayow, Waayo, cadaawayaashaydii oo
dhan waxaad ku dhufatay dhabanka, Oo kuwa sharka leh
ilkahoodiina waad jejebisay. 8 Badbaado waxaa leh Rabbiga,
Barakadaadu dadkaaga ha ku soo degto. (Selaah)

4 Ilaaha xaqnimadaydow, markii aan ku baryo i maqal,
Markii aan cidhiidhi ku jirayba meel baad ii bannaysay,
Ii naxariiso oo baryadayda maqal. 2 Binu-aadmigow,
ilaa goormaa sharaftaydu sharafjab u rogmanaysaa? Ilaa
goormaad wax aan micne lahayn jeclaanaysaan? Oo ilaa
goormaad been doondoonaysaan? (Selaah) 3 Laakiinse
ogaada in Rabbigu gooni ahaan isugu soocay kii cibaado
leh, Rabbigu wuu maqli doonaa markii aan u yeedho
isaga. 4 Cadhooda oo ha dembaabina, Qalbigiinna la hadla
markii aad sariirtiinna ku jiiftaan, oo aamusa. (Selaah) 5
Bixiya allabaryadii xaqnimada, Oo Rabbiga isku halleeya. 6
Waxaa jira kuwo badan oo yidhaahda, Bal yaa wanaag na
tusaya? Rabbiyow, iftiinka wejigaaga nagu ifi. 7 Waxaad
qalbigayga gelisay farxad Ka sii badan tan ay helaan
markii hadhuudhkooda iyo khamrigoodu ay kordhaan. 8
Nabad baan ku jiifsanayaa oo aan ku seexanayaa, Waayo,
Rabbiyow, adigoo keliya ayaa ammaan igu bariiya.

5 Rabbiyow, bal hadalladayda dhegta u dhig, Oo ka
fiirso fikirradayda. 2 Boqorkayga iyo Ilaahaygow, bal
maqal codka baryadayda, Waayo, adigaan kuu tukanayaa.
3 Rabbiyow, codkayga aroorta baad maqli doontaa, Oo
aroorta ayaan tukashadayda kugu soo hagaajin doonaa,
oo waan soo jeedi doonaa. 4 Waayo, adigu ma ihid
Ilaah xumaanta ku farxa, Oo shar adiga kula jiri maayo.
5 Kan ismadax-weyneeya hortaada soo istaagi maayo,
Oo waxaad neceb tahay xumaanfalayaasha oo dhan. 6
Waad wada baabbi'in doontaa kuwa beenta ku hadla,
Rabbigu aad buu u karhaa kan dhiigyacabka ah iyo
khaa'inkaba. 7 Laakiinse anigu kalgacaylkaaga badan ayaan
gurigaaga ku soo gelayaa, Oo anigoo kaa cabsanaya ayaan
xagga macbudkaaga quduuska ah u soo tukan doonaa. 8
Rabbiyow, cadaawayaashayda daraaddood xaqnimadaada
igu hoggaami, Oo jidkaaga hortayda ku toosi. 9 Waayo,
afkooda daacadnimo kuma jirto, Oo uurkooda hoosena waa
xumaan miidhan, Hungurigooduna waa qabri af bannaan, Oo
carrabkooduna waa sasabasho miidhan. 10 Ilaahow, iyaga
kuwo eed leh ku tiri, Oo iyagu taladooda ha ku baabbe'een,

Oo xadgudubkooda batay daraaddiis u tuur iyaga, Waayo,
way kugu caasiyoobeen. **11** Laakiinse kuwa adiga isku
kaa halleeya oo dhammu ha reyreeyeen, Oo farxad ha
ku qayliyeen weligoodba, maxaa yeelay, adigaa daafaca
iyaga, Kuwa magacaaga jeceluna adiga ha kugu farxeen.
**12** Waayo, Rabbiyow, kii xaq ah waad barakayn doontaa,
Oo waxaad hareerihiisa ku wareejinaysaa raallinimo sidii
gaashaan oo kale.

**6** Rabbiyow, cadhadaada ha igu canaanan, Oo dhirifkaaga
kululna ha igu edbin. **2** Rabbiyow, ii naxariiso, waayo,
anigu waan taagdaranahay, Rabbiyow, i bogsii, waayo,
lafahaygu way dhib qabaan. **3** Oo weliba naftayduna aad
iyo aad bay u dhibaataysan tahay, Adiguse, Rabbiyow, ilaa
goormaad sugaysaa? **4** Rabbiyow, soo noqo oo naftayda
samatabbixi, Oo igu badbaadi raxmaddaada daraaddeed.
**5** Waayo, geeridu ma leh xusuus adiga lagugu xusuusto,
Bal yaase She'ool kaaga mahadnaqi doona? **(Sheol h7585)** **6**
Waxaan la daalay jibaadkayga, Habeen kasta sariirtayda
oohin baan ku qoyaa. Gogoshaydana waxaan ku qoyaa
ilmadayda. **7** Ishaydu waxay la gudhaysaa tiiraanyo, Oo
cadaawayaashayda daraaddood ayay la gabowdaa. **8** Iga
taga, kuwiinna xaqdarrada ka shaqeeya oo dhammow,
Waayo, Rabbigu waa maqlay codkii oohintayda. **9** Rabbigu
waa maqlay baryootankaygii, Oo Rabbigu waa aqbalayaa
tukashadayda. **10** Cadaawayaashayda oo dhammu way
wada ceeboobi doonaan, oo aad iyo aad bay u dhibtoon
doonaan, Dib bay u noqon doonaan, oo si kediso ah ayay u
ceeboobi doonaan.

**7** Rabbiyow, Ilaahayow, adigaan isku kaa halleeyaa,
Haddaba iga badbaadi kuwa i eryanaya oo dhan, oo iga
samatabbixi, **2** Waaba intaasoo ay naftayda sida libaax oo
kale u kala dildillaaciyaane, Oo ay i kala jeexjeexaan intii
aanay jirin cid iga samatabbixisaa. **3** Rabbiyow, Ilaahayow,
haddii aan waxan sameeyey, Haddii xumaanu gacmahayga
ku jirto, **4** Haddii aan shar ugu abaalguday mid ila nabad ah,
(Haah, oo waxaan samatabbixiyey kii sababla'aan cadowga
iigu ahaa, ) **5** De markaas cadowgu naftayda ha eryado, oo
ha qabsado, Oo isagu ha igu tunto, Oo sharaftaydana ciidda
ha ku rido. (Selaah) **6** Rabbiyow, cadhadaada la kac, Oo ku
kac dhirifka cadaawayaashayda, Aniga daraadday u sara
joogso, waayo, waxaad amartay xukun. **7** Oo dadyowga
ururradoodu ha ku hareereeyeen, Oo adna iyaga xagga
sare uga noqo. **8** Rabbigu dadyowga buu u garsooraa,
Rabbiyow, ii xukun siday xaqnimadaydu tahay, iyo siday
daacadnimadayda igu jirtaa tahay. **9** Kuwa sharka leh
sharkoodu ha dhammaado, laakiinse xoogee kuwa xaqa
ah, Waayo, Ilaaha xaqa ahu wuxuu imtixaamaa qalbiga iyo
uurka. **10** Gaashaankaygu wuxuu la jiraa Ilaaha Badbaadiya
kuwa qalbigoodu qumman yahay. **11** Ilaah waa xaakin xaq
ah, Oo waa Ilaah maalin kasta dhirifsan. **12** Haddii aan laga
noqon, isagu seeftiisuu afaysan doonaa, Qaansadiisana
wuu xootay, oo wuu diyaarsaday. **13** Oo weliba wuxuu
diyaarsaday alaabtii dhimashada, Oo fallaadhihiisana wuxuu
ka dhigtaa kuwo ololaya. **14** Bal eega, ninku wuxuu la
dhibtoodaa xumaan, Oo wuxuu wallacay belaayo, oo wuxuu
dhalay been. **15** Booraan buu sameeyey, oo uu qoday,
Oo wuxuu ku dhacay bohoshii uu isagu sameeyey. **16**
Belaayadiisu waxay dib ugu noqonaysaa madaxiisa, Oo
dulmigiisuna dhaladiisuu ku soo degayaa. **17** Rabbiga waan
ugu mahadnaqayaa sida ay xaqnimadiisu tahay, Oo waxaan
u ammaanayaa magaca Rabbiga ah Ilaaha ugu sarreeya.

**8** Rabbiyow, Sayidkayagiiyow, Magacaagu dunida oo dhan
ku fiicanaa! Waayo, sharaftaadii waxaad ka sarraysiisay
samooyinka. **2** Waxaad xoog u yeeshay afka ilmaha yaryar
iyo caanonuugga, Waana cadaawayaashaada daraaddood,
Si aad u aamusiisid cadowga iyo aardoonka. **3** Markaan
ka fiirsado samooyinka farahaaga lagu sameeyey, Iyo
dayaxa iyo xiddigaha aad amartay, **4** Bal waa maxay
dadku oo aad u xusuusataa isaga? Iyo wiilka aadanaha
oo aad u soo booqataa? **5** Waayo, waxaad isaga wax yar
ka hoosaysiisay malaa'igaha, Waxaanad taaj uga dhigtay
ammaan iyo murwad. **6** Oo waxaad isaga ka dhigtay inuu u
taliyo shuqullada gacmahaaga, Oo wax walbana cagihiisaad
ka hoosaysiisay, **7** Idaha iyo lo'da oo dhan, Iyo xayawaanka
duurka joogaba, **8** Iyo haadka hawada, iyo kalluunka badda,
Iyo wax alla waxa ku dhex socda waddooyinka badaha. **9**
Rabbiyow, Sayidkayagiiyow, Magacaagu dunida oo dhan ku
fiicanaa!

**9** Qalbigayga oo dhan ayaan Rabbiga ugu mahadnaqi
doonaa, Waxaan muujin doonaa shuqulladaada yaabka
leh oo dhan. **2** Waan kugu farxi doonaa oo kugu rayrayn
doonaa, Kaaga ah kan ugu sarreeyow, magacaaga ayaan
ammaan ugu gabyi doonaa. **3** Cadaawayaashaydu markii
ay dib u noqdaan, Way kufaan, oo waxay ku halligmaan
hortaada. **4** Waayo, adigu xaqaygii iyo dacwadaydiiba
waad ilaalisay, Carshigaad ku fadhiday adigoo si xaq ah
wax u xukumaya. **5** Quruumaha ayaad canaanatay, oo
kuwa sharka lehna waad baabbi'isay, Oo magacoodiina
waad tirtirtay weligiis iyo weligiis. **6** Cadaawayaashii
way dhammaadeen, oo weligoodba waa baabba', Oo
magaalooyinkii aad afgembidayna Xataa xusuustoodii waa
baabba'day. **7** Laakiinse Rabbigu wuxuu weligiis u fadhiyaa

sida boqor, Oo carshigiisiina wuxuu u diyaarsaday garsoorid.
8 Oo dunida xaqnimuu ku xukumi doonaa. Oo dadyowgana
qummanaan buu ugu garsoori doonaa. 9 Oo weliba Rabbigu
wuxuu kuwa la dulmay u noqon doonaa magangal. Oo kolkii
ay dhibaataysan yihiinna magangal buu u ahaan doonaa,
10 Oo kuwa magacaaga yaqaanna way isku kaa hallayn
doonaan, Waayo, adigu Rabbiyow, ma aad dayrisid kuwa ku
doondoona. 11 Rabbiga Siyoon deggan ammaan ugu gabya,
Oo waxyaalahuu sameeyey dadka dhexdiisa ka caddeeya.
12 Waayo, waxaa iyaga xusuusta ka dhiigga ka aarguda,
Oo isagu ma illoobo qaylada masaakiinta. 13 Rabbiyow, ii
naxariiso, Bal eeg dhibaatada ay kuwa i necebu igu hayaan.
Waxaad kor iiga qaaddaa irdaha dhimashada, 14 Si aan u
muujiyo ammaantaada oo dhan, Badbaadadaada aawadeed
ayaan ugu farxi doonaa irdaha Siyoon. 15 Quruumihii waxay
ku dheceen yamayskii ay qodeen, Oo cagtoodiina waxaa
qabsaday shabaggii ay qariyeen. 16 Rabbigu waa ismuujiyey,
oo xukun buu dejiyey, Kii shar lahaa waxaa dabay shuqulkii
gacmihiisa. (Higgayoon. (Selaah) 17 Kuwa sharka lahu
waxay ku noqonayaan She'ool, Waana quruumaha Ilaah
illoobay oo dhan. **(Sheol h7585)** 18 Waayo, kan baahan mar
walba lama illoobi doono, Oo masaakiinta waxfilashadooduna
weligeed ma baabba'sanaan doonto. 19 Rabbiyow, sara
joogso, oo dadku yaanay adkaan. Quruumaha hortaada ha
lagu xukumo. 20 Rabbiyow, iyaga cabsi geli, Oo quruumuhu
ha is-ogaadeen inay dad uun yihiin. (Selaah)

**10** Rabbiyow, maxaad meesha fog u istaagtay? Oo
maxaad u dhuumataa markii dhibaato jirto? 2 Kii shar
leh oo kibir badan ayaa miskiinka si kulul u eryada, Xeeladdii
ay hindiseen iyaga ha la rogmato. 3 Waayo, kii shar lahu
wuxuu ku faanaa waxa qalbigiisu jecel yahay, Oo kii damaci
ahuna Rabbiga wuu nacaa, wuuna quudhsadaa. 4 Kii shar
lahu isagoo wejigiisa kibir ka muuqdo wuxuu yidhaahdaa,
Isagu waxba i weyddiisan maayo. Fikirradiisa oo dhammu
waxaa weeye, Ilaah ma jiro. 5 Jidadkiisuu ku adag yahay
had iyo goorba, Xukummadaaduna waa ka sarreeyaan
isaga, waana ka fog yihiin, Oo cadaawayaashiisa oo dhanna
wuu wada fudaydsadaa. 6 Oo wuxuu isyidhaahdaa, Anigu
weligay dhaqdhaqaaqi maayo, Oo tan iyo ka ab ka ab
xumaanu i heli mayso. 7 Afkiisa waxaa ka buuxa habaar iyo
khiyaano iyo dulmi, Oo carrabkiisana waxaa ku hoos jira
belaayo iyo xumaan. 8 Isagu wuxuu fadhiistaa tuulooyinka
meelahooda lagu dhuunto, Oo kan aan xaqa qabinna wuxuu
ku dilaa meelaha qarsoon, Oo indhihiisuna waxay si qarsoon
hoos uga fiiriyaan miskiinka. 9 Isagu wuxuu ku dhuuntaa
meel qarsoon sida libaax godkiisa ku jira, Oo wuxuu u
gaadaa inuu miskiinka qabsado, Oo intuu miskiinka qabsado
ayuu ku soo jiitaa shabaggiisa. 10 Wuu foororsadaa, oo
hoos isu gaabiyaa, Oo masaakiinta waxaa ridda gacanta
kuwiisa xoogga badan. 11 Oo wuxuu isyidhaahdaa, Ilaah
waa i illoobay, Oo wejigiisiina wuu qariyey, weligiisna ima arki
doono. 12 Rabbiyow, Ilaahow, sara joogso, oo gacantaada
kor u qaad, Oo masaakiinta ha illoobin. 13 Bal kii shar
lahu muxuu Ilaah u quudhsadaa? Oo muxuu qalbigiisa
uga leeyahay, Adigu waxba i weyddiisan maysid? 14
Waxaas baad aragtay, waayo, waad u jeeddaa belaayada
iyo xanaaqa, inaad gacantaada ku aargudatid aawadeed,
Miskiinku adiguu isu kaa dhiibaa, Waayo, adigu waxaad
tahay agoonka kaalmeeyihiisa. 15 Kii shar leh gacantiisa jebi,
Oo sharrowga xumaantiisana doondoon ilaa aad mid dambe
weydid. 16 Rabbigu waa boqor weligiis iyo weligiisba, Oo
quruumaha oo dhammuna dalkiisa way ka wada baabba'aan.
17 Rabbiyow, waad maqashay waxay kuwa is-hoosaysiiyaa
doonayaan, Oo qalbigooda waad diyaarin doontaa, oo
dhegtaadana waad u dhigi doontaa, 18 Si aad gartooda u
naqdid agoonta iyo kuwa la dulmay, Si aan dadka dunidu
mar dambe u noqon kuwo laga cabsado.

**11** Anigu Rabbigaan isku halleeyaa, Haddaba idinku sidee
baad naftayda ugu tidhaahdaan, Sida shimbir oo kale
buurtiinnii ku carara? 2 Waayo, bal eega, kuwa sharka
lahu waxay xoodaan qaansada, Fallaadhoodana waxay ku
diyaariyaan xadhigga, Inay kan qalbiga ka qumman goor
gudcur ah ku ganaan. 3 Haddii aasaaska la dumiyo, Kan
xaqa ahu bal muxuu samayn karaa? 4 Rabbigu wuxuu
ku jiraa macbudkiisa quduuska ah, Rabbiga carshigiisu
wuxuu yaal samada, Indhihiisu way eegaan, oo indhihiisa
daboolkooduna way imtixaamaan binu-aadmiga. 5 Rabbigu
waa tijaabiyaa kii xaq ah, Laakiinse kii shar leh iyo kii dulmi
jecelba naftiisu way neceb tahay. 6 Kuwa shar leh wuxuu ku
soo kor daadin doonaa dabinno, Oo qaybta koobkooduna
waxaa weeye dab iyo baaruud iyo dabayl hanfi ah. 7 Waayo,
Rabbigu waa xaq, oo isagu xaqnimaduu jecel yahay, Kuwa
qummanuna wejigiisay arki doonaan.

**12** Rabbiyow, dadkaaga caawi, waayo, nin cibaado leh
waa la waayayaa, Waayo, binu-aadmiga intii aaminka
ahayd way ka dhammaadeen. 2 Mid walba deriskiisa
wuxuu kula hadlaa been, Oo waxay ku hadlaan bushimo
sasabasho miidhan ah iyo laba qalbi. 3 Rabbigu wuxuu wada
baabbi'in doonaa bushimaha sasabashada badan oo dhan,
Iyo carrabka waxyaalaha waaweyn ku hadlaba. 4 Kuwaasu
waxay yidhaahdeen, Annagu waxaan ku adkaan doonnaa
carrabkayaga, Oo bushimahayagana annagaa iska leh.

Haddaba bal yaa annaga sayid noo ah? 5 Rabbigu wuxuu
leeyahay, Anigu haatan waxaan u kacayaa Masaakiinta la
dhacayo, iyo kuwa baahan taahiddooda daraaddood, Oo kan
ay fudaydsanayaanna waan ammaan gelinayaa. 6 Rabbiga
erayadiisu waa erayo daahir ah, Oo waa sida lacag foorno
kulul oo dhulka ku taal lagu kala miiray, Oo toddoba jeer la
safeeyey. 7 Rabbiyow, waad dhawri doontaa, Oo qarnigan
ayaad iyaga ka xannaanayn doontaa weligood. 8 Markii
nijaasta binu-aadmiga dhexdiisa lagu jecel yahay, Kuwa
sharka lahu waxay ku socdaan dhinac kasta.

**13** Rabbiyow, ilaa goormaad i illoobaysaa? Ma weligaa
baa? Oo ilaa goormaad wejigaaga iga qarinaysaa? 2
Ilaa goormaan naftayda la tashanayaa, Anigoo maalinta oo
dhan calool xun? Ilaa goormuu cadowgaygu iga sarraynayaa?
3 Rabbiyow Ilaahayow, waxaas u fiirso, oo ii jawaab,
Indhahayga iftiimi, yaanan hurdadii geerida seexanine, 4
Waaba intaasoo cadowgaygu yidhaahdaa, Anigu isagaan
ka adkaaday, Oo ay cadaawayaashaydu farxaan markii
lay dhaqaajiyo. 5 Laakiinse anigu waxaan isku halleeyey
naxariistaada, Oo qalbigayguna wuxuu ku rayrayn doonaa
badbaadintaada. 6 Rabbigaan u gabyi doonaa, Maxaa
yeelay, wax badan oo wanaagsan buu ii sameeyey.

**14** Nacasku wuxuu qalbigiisa iska yidhaahdaa, Ilaah ma
jiro. Iyagu way kharriban yihiin, oo waxay sameeyeen
shuqullo karaahiyo ah, Ma jiro mid wanaag sameeya. 2
Rabbigu samaduu ka soo fiiriyey binu-aadmiga, Inuu arko
haddii ay jiraan kuwo wax garanaya, Oo Ilaah doondoona.
3 Dhammaantood gees bay u wada leexdeen, oo way
wada nijaasoobeen, Mid wanaag falaa ma jiro, midnaba. 4
Xumaanfalayaasha oo dhammu miyaanay aqoon lahayn?
Iyagoo dadkayga cuna, siday kibista u cunaan, Mana
ay baryaan Rabbiga. 5 Halkaasay aad ugu cabsadeen,
Maxaa yeelay, Ilaah wuxuu la jiraa qarniga xaqa ah.
6 Idinku waxaad ceebaysaan talada miskiinka, Laakiin
Rabbigu waa magangalkiisa. 7 Badbaadada reer binu
Israa'iil bal may Siyoon ka timaado! Marka Rabbigu dadkiisa
maxaabiisnimada ka soo celiyo, Ayaa reer Yacquub rayrayn
doonaa, oo reer binu Israa'iilna farxi doonaa.

**15** Rabbiyow, bal yaa taambuuggaaga ku fadhiyaya? Oo
bal yaa buurtaada quduuska ah degganaanaya? 2
Waa kii si qumman u socda, oo xaqnimo sameeya, Oo
qalbigiisa run kaga hadla. 3 Waana kii aan carrabkiisa wax
ku xaman, Ama aan saaxiibkiis xumaan ku samayn, Ama
aan deriskiisa cay ku soo hadal qaadin, 4 Kii indhihiisu ay
nejiska quudhsadaan, Oo isagu murweeya kuwa Rabbiga ka
cabsada, Kii hadduu dhaarto oo ay waxyeello ku tahay, aan
isbeddelin, 5 Kii aan lacagtiisa u soo bixin korsocod, Ama
aan laaluush u qaadan inuu wax yeelo kuwa aan xaqa qabin.
Kii waxyaalahaas sameeya weligiis lama dhaqaajin doono.

**16** Ilaahow, i dhawr, waayo, adigaan isku kaa halleeyaa.
2 Waxaan Rabbiga ku idhi, Sayidkayga baad tahay,
Oo innaba wanaag ma haysto la'aantaa. 3 Quduusiinta
dhulka joogtaa Waxaa weeye kuwa sharafta leh oo aan
aad iyo aad ula faraxsanahay. 4 Kuwa ilaaha kale u
dheereeya murugtoodu waa badnaan doontaa, Laakiinse
anigu bixin maayo qurbaankooda cabniinka oo dhiigga ah,
Oo magacyadoodana bushimahayga ku soo qaadi maayo. 5
Rabbigu waxaa weeye qaybtii dhaxalkayga iyo koobkayga,
Adigu qaybtayda waad xannaanaysaa. 6 Dhulqaybsigii
meelo wacan baan ku helay, Haah, oo waxaan leeyahay
dhaxal wanaagsan. 7 Anigu waxaan ammaanayaa Rabbiga i
waaniyey, Habeenkiina uurkaygu wax buu i baraa. 8 Had iyo
jeerba Rabbigaan hortayda ku xusuustaa, Oo anigu innaba
dhaqdhaqaaqi maayo, Maxaa yeelay, isagu wuxuu joogaa
midigtayda. 9 Taas aawadeed qalbigaygu waa faraxsan
yahay oo naftayduna way rayraysaa, Oo weliba jidhkayguna
ammaan buu ku jiri doonaa. 10 Maxaa yeelay, naftayda
She'ool kuma dayn doontid, Kaaga quduuska ahna uma
dayn doontid inuu qudhun arko. **(Sheol h7585)** 11 Waxaad i
tusi doontaa jidka nolosha, Hortaada farxad baa ka buuxda,
Gacantaada midigna nimco baa ku jirta weligeed.

**17** Rabbiyow, xaqa maqal, oo qayladayda u jeeso, Oo
baryadayda dhegta u dhig, taasoo aan ka bixin bushimo
khiyaano leh. 2 Xukunkaygu ha ka yimaado hortaada,
Oo indhahaaguna caddaalad ha fiiriyeen. 3 Qalbigayga
waad tijaabisay, oo habeennimaad i soo booqatay, Waad i
imtixaantay, oo wax shar ah igama aad helin, Waxaan u
qasdiyey inaanu afkaygu xadgudbin. 4 Shuqulladii dadkana
waan ka hadhay, Oo erayada bushimahaaga ayaan kaga
joogsaday jidadkii kuwa wax dulma oo dhan. 5 Si aanay
cagahaygu u simbiriirixan, Tallaabooyinkayga ku adkee
waddooyinkaaga. 6 Ilaahow, waan ku baryay, waayo, waad
ii jawaabi doontaa, Bal dhegta ii dhig, oo hadalkayga maqal.
7 Bal muuji raxmaddaada yaabka leh, Adigoo kuwa isku
kaa halleeya gacantaada midig kaga badbaadiya Kuwa ku
kaca iyaga. 8 Ii dhawr sida isha inankeeda, Oo igu qari
hooska baalashaada. 9 Waxaad iga qarisaa kuwa sharka leh
oo i kharriba, Kuwaas oo ah cadaawayaasha naftayda oo
hareerahayga ku wareegsan. 10 Qalbigooday xidheen, Oo
afkooduna wuxuu ku hadlaa waxyaalo kibir miidhan ah. 11 Oo
haatan waxay cidhiidhiyeen tallaabooyinkayagii, Oo waxay

noogu dhaygageen inay dhulka nagu tuuraan aawadeed. 12
Isagu waa sida aar libaax ugaadhsi damacsan, Iyo sida aaran
libaax oo meelo qarsoon ku dhuunta. 13 Rabbiyow, kac, Oo
isaga ka hor tag, oo dhulka hoos ugu tuur, Oo naftaydana
kan sharka leh seeftaada kaga samatabbixi, 14 Rabbiyow,
waxaad dadka igaga samatabbixisaa gacantaada, Kuwaas oo
ah dadka dunida, oo qaybtoodu ku jirto nolosha adduunkan,
Oo aad calooshooda ka buuxisaa khasnaddaada, Iyagu
waxay ka dhergeen carruur, Oo maalkooda hadhayna waxay
uga tagaan dhallaankooda. 15 Laakiinse anigu xaqnimaan
wejigaaga ku fiirin doonaa, Oo waa i deeqi doonaa markii
aan ammaantaada arko, oo aan ekaantaada la soo tooso.

**18** Rabbiyow, xooggaygiiyow, anigu waan ku jeclahay.
2 Rabbigu waa dhagax weyn oo ii gabbaad ah iyo
qalcaddayda, iyo samatabbixiyahayga, Iyo Ilaahay, iyo
gabbaadkayga adag, oo isagaan isku hallayn doonaa,
Isagu waa gaashaankayga, iyo geeska badbaadadayda,
iyo munaaraddayda dheer. 3 Waxaan baryayaa Rabbiga
istaahila in la ammaano, Oo sidaasaan cadaawayaashayda
kaga badbaadi doonaa. 4 Waxaa i hareereeyey xadhkihii
dhimashada, Oo waxaa i cabsiiyey daadkii cibaadala'aanta.
5 Waxaa igu wareegsanaa xadhkihii She'ool, Oo waxaa i
qabsaday dabinnadii dhimashada. **(Sheol h7585)** 6 Anigoo
cidhiidhi ku jira ayaan Rabbiga baryay, Oo waxaan u
qayshaday Ilaahay, Isna codkayguu macbudkiisa ka maqlay,
Oo qayladayda hortiisa ka yeedhaysaana dhegihiisay
gashay. 7 Markaasaa dhulku ruxmay oo gariiray, Oo buuraha
aasaaskoodiina wuu dhaqdhaqaaqay, Oo wuu ruxmay,
maxaa yeelay, Ilaah waa cadhaysnaa. 8 Dulalka sankiisa
waxaa ka soo baxay qiiq, Afkiisana waxaa ka soo baxay
dab wax gubaya, oo dhuxulaa ka shidmay isaga. 9 Oo
weliba samooyinka wuu soo foorarshay, oo hoos buu u soo
degay, Oo cagihiisana waxaa hoos yiil gudcur weyn. 10 Oo
wuxuu fuulay keruub, wuuna duulay, Haah, oo wuxuu si
dheeraysa ugu duulay oo fuulay dabaysha baalasheeda. 11
Wuxuu gudcurka ka dhigtay meeshiisii dhuumashada, iyo
taambuuggiisa hareerihiisa ku wareegsan, Iyo biyo gudcur
ah, iyo daruuraha qarada waaweyn oo cirka. 12 Nuurkii
hortiisa yiil aawadiis ayay daruurihii qarada waaweynaa
tageen, Roobkii dhagaxyada lahaa iyo dhuxulihii dabka
ahaana way carareen. 13 Rabbiguna wuxuu ka onkoday
samooyinka, Sarreeyuhuna wuxuu ku hadlay codkiisii,
Oo soo daayay roob dhagaxyaale iyo dhuxulo dab ah.
14 Markaasuu fallaadhihiisii soo ganay oo kala firdhiyey
iyagii, Haah, oo wuxuu u soo diray hillaac badan, wuuna
baabbi'iyey iyagii. 15 Rabbiyow, canaantaadii aawadeed iyo
dulalka sankaaga neefta ka soo baxaysa aawadeed Ayaa
durdurradii biyuhu la muuqdeen, Oo aasaaskii duniduna
wuu soo bannaan baxay. 16 Xagga sare ayuu cid ka soo
diray, oo wuu i qaaday, Oo wuxuu iga soo dhex bixiyey
biyo badan. 17 Wuxuu iga samatabbixiyey cadowgaygii
xoogga badnaa, Iyo kuwii i necbaaba, waayo, iyagu way
iga xoog badnaayeen. 18 Waxay igu soo kediyeen maalintii
aan belaayaysnaa, Laakiinse Rabbigu wuxuu ii ahaa tiir.
19 Oo weliba wuxuu i keenay meel ballaadhan, Wuu i soo
samatabbixiyey, maxaa yeelay, wuu igu farxay. 20 Rabbigu
wuxuu iigu abaalguday sidii ay xaqnimadaydii ahayd, Oo sidii
ay nadiifsanaantii gacmahaygu ahayd ayuu iigu abaalguday.
21 Waayo, anigu waan xajiyey jidadkii Rabbiga, Oo Ilaahayna
si caasinimo ah ugama tegin. 22 Waayo, xukummadiisii oo
dhammu hortayday yiilleen, Oo qaynuunnadiisiina anigu
iskama tuurin. 23 Oo weliba xaggiisana waan ku qummanaa,
Oo waan iska dhawray xumaantaydii. 24 Sidaas daraaddeed
ayaa Rabbigu iigu abaalguday sidii ay xaqnimadaydii ahayd,
Iyo sidii nadiifsanaanta gacmahaygu ay ku ahayd indhihiisa
hortooda. 25 Kii naxariis leh waad u naxariisanaysaa,
Oo ninkii qummanna waad u qummanaanaysaa. 26 Kii
daahir ahna daahir baad u ahaanaysaa, Oo kii qalloocanna
mid maroorsan baad u ahaanaysaa. 27 Waayo, waxaad
badbaadinaysaa dadka dhibaataysan, Laakiinse indhaha
kibirsan waad soo dejinaysaa. 28 Waayo, waxaad daaraysaa
laambaddayda, Rabbiga Ilaahayga ah ayaa gudcurkayga
iftiiminaya. 29 Waayo, adaan col kuugu dhex ordaa, Oo
Ilaahay caawimaaddiisa ayaan derbi kaga boodaa. 30
Ilaah jidkiisu waa qumman yahay, Rabbiga eraygiisuna waa
mid la tijaabiyey, Isagu wuxuu gaashaan u yahay kuwa
isaga isku halleeya oo dhan. 31 Waayo, bal yaa Ilaah
ah, Rabbiga mooyaane? Oo bal yaa dhagax weyn ah,
Ilaahayaga mooyaane? 32 Kaasoo ah Ilaaha ii guntiya xoog,
Jidkaygana qummaatiya. 33 Isagu cagahayga wuxuu ka
dhigaa sida cagaha deerada, Oo wuxuu igu fadhiisiyaa
meelahayga sare. 34 Gacmahaygana wuxuu baraa dagaalka,
Oo sidaas daraaddeed gacmahaygu waxay xoodaan qaanso
naxaas ah. 35 Weliba waxaad kaloo i siisay gaashaankii
badbaadintaada, Oo waxaa kor ii qaadday gacantaada
midig, Oo roonaantaada ayaa i weynaysay. 36 Adigu
tallaabooyinkayga waxaad ku ballaadhisay hoostayda, Oo
cagahayguna ma ay simbiriirixan. 37 Anigu waxaan eryan
doonaa cadaawayaashayda, oo waan gaadhi doonaa, Oo
jeeray wada baabba'aanna dib uga soo noqon maayo. 38
Waan wada layn doonaa si aanay mar dambe u awoodin
inay kacaan, Oo cagahaygay ku soo hoos dhici doonaan.
39 Waayo, xoog baad iigu guntisay dagaalka aawadiis, Oo

kuwii igu kacayna hoostaydaad ku soo tuurtay. 40 Oo weliba
cadaawayaashaydii waxaad ka dhigtay inay dhabarka ii
jeediyaan, Si aan u kala gooyo kuwa i neceb. 41 Iyagu way
qayshadeen, laakiinse way waayeen mid iyaga badbaadiya,
Oo xataa Rabbiga way baryeen, laakiinse uma uu jawaabin.
42 Markaasaan iyagii u duqeeyey sida boodhka dabaysha hor
kaca, Oo waxaan iyagii dibadda ugu tuuray sidii dhoobada
jidadka taal oo kale. 43 Waxaad iga samatabbixisay murankii
dadka, Oo waxaad iga dhigtay quruumaha madaxdoodii,
Oo dad aanan aqoon ayaa ii adeegi doona. 44 Oo mar
alla markii ay warkayga maqlaan way i addeeci doonaan,
Oo shisheeyayaashuna way isu kay dhiibi doonaan, 45
Shisheeyayaashu way libdhi doonaan, Oo iyagoo gariiraya
ayay qolalkooda ka soo bixi doonaan. 46 Rabbigu waa
nool yahay, oo mahad waxaa leh dhagaxayga weyn, Oo
Ilaaha i badbaadiyeyna ha sarreeyo, 47 Kaasoo ah Ilaaha
aniga ii aarguda, Oo dadkana hoostayda ku soo tuura. 48
Isagu wuxuu iga badbaadiyaa cadaawayaashayda, Haah,
oo adigu waxaad iga sara marisaa kuwa igu kaca, Oo
waxaad iga samatabbixisaa ninka dulmiga badan. 49 Sidaas
daraaddeed, Rabbiyow, anigu waxaan kuugu mahadnaqi
doonaa quruumaha dhexdooda, Oo magacaaga ammaan
baan ugu gabyi doonaa. 50 Rabbigu si weyn buu boqorkiisa
u samatabbixiyaa, Oo wuxuu weligiis raxmad u sameeyaa kii
uu subkaday, Kaasoo ah Daa'uud, iyo farcankiisaba weligiis
iyo weligiis.

**19** Samooyinku waxay caddeeyaan ammaanta Ilaah,
Cirkuna wuxuu muujiyaa sancadii gacantiisa. 2
Maalinba maalinta ka dambaysaa waxay ku hadashaa
hadal, Oo habeenba habeenka ka dambeeyaa wuxuu
caddeeyaa aqoon. 3 Ma jiro hadal ama af Aan codkooda
laga maqlin. 4 Codkoodii wuxuu dhex maray dhulka oo
dhan, Hadalkoodiina wuxuu gaadhay dunida meesha ugu
dambaysa. Oo dhexdooda wuxuu taambuug u dhigay
qorraxda, 5 Taasoo la mid ah aroos qolladdiisii ka soo baxaya,
Oo waxay u faraxdaa sida nin xoog leh oo baratamaya. 6
Waxay ka soo baxdaa samada darafkeeda, Oo waxay ku
soo wareegtaa hareeraheeda, Oo kulaylkeedana wax ka
qarsoonu ma jiraan. 7 Sharciga Rabbigu waa kaamil, oo
nafta wuu soo celiyaa, Maragfurka Rabbigu waa aamin, oo
garaadlaawaha ayuu u caqliyeeyaa. 8 Qaynuunnada Rabbigu
waa hagaagsan yihiin, oo qalbiga ayay ka farxiyaan, Amarka
Rabbigu waa daahir oo indhaha ayuu nuuriyaa. 9 Cabsida
Rabbigu waa nadiif, weligeedna way raagtaa, Xukummada
Rabbigu waa run, waana wada xaq dhammaantood. 10
Iyagu waa wax xataa dahab laga sii jeclaado, haah, xataa
dahab badan oo saafi ah, Oo weliba way ka sii macaan yihiin
malab iyo awlallada malabka. 11 Oo weliba addoonkaagana
iyagaa loogu digay, Oo xajintoodana waxaa ku jira abaalgud
weyn. 12 Bal yaa qaladdadiisa garan kara? Rabbow, iga
nadiifi dembiyo qarsoon. 13 Anoo addoonkaaga ah iga hay
waxyaalo aan ku kibro, Oo yaanay ii talin, Oo markaas kaamil
baan ahaan doonaa, Oo xadgudub weynna daahir baan ka
ahaan doonaa. 14 Rabbiyow, xooggayga iyo bixiyahaygiiyow,
Erayada afkayga iyo fikirka qalbigaygu ha ahaadeen kuwo
hortaada lagu aqbalo.

**20** Rabbigu ha kuu jawaabo maalinta dhibta, Ilaaha
Yacquub magiciisu meel sare ha ku taago, 2
Caawimaadna ha kaaga soo diro meesha quduuska ah, Oo
Siyoonna ha kaa xoogeeyo, 3 Ha xusuusto qurbaannadaadii
oo dhan, Oo ha aqbalo allabarigaagii gubnaa, (Selaah)
4 Oo ha ku siiyo waxa qalbigaagu doono, Oo ha kuu
yeelo muraadkaaga oo dhan. 5 Innagu waxaynu ku
guulaysanaynaa badbaadintaada, Oo calammadeennana
waxaynu ku sudhaynaa magaca Ilaaheenna, Rabbigu ha
ku siiyo waxaad weyddiisato oo dhan. 6 Anigu hadda
waan ogahay in Rabbigu badbaadiyo kii uu isagu subkaday,
Oo wuxuu isaga uga soo jawaabi doonaa samadiisa
quduuska ah, Oo wuxuuna ugu jawaabi doonaa xooggiisa
wax badbaadiya oo gacantiisa midig. 7 Qaar waxay isku
halleeyaan gaadhifardoodyo, qaarna waxay isku halleeyaan
fardo, Laakiinse innagu waxaynu xusuusanaynaa magaca
Rabbiga Ilaaheenna ah. 8 Iyagu way foororsadeen, wayna
dheceen, Laakiinse innagu waynu kacnay, oo waynu taagan
nahay. 9 Rabbiyow, ina badbaadi, Oo Boqorku ha inoo
jawaabo markii aynu u qayshanno.

**21** Rabbiyow, boqorku wuxuu ku farxi doonaa xooggaaga,
Oo badbaadintaadana aad buu ugu rayrayn doonaa.
2 Waxaad isaga siisay wixii qalbigiisu doonayay, Oo wixii
bushimihiisu ku weyddiisteenna uma aad diidin. (Selaah) 3
Waayo, waxaad isaga hor dhigtaa barakooyinka wanaagga,
Oo madaxiisana waxaad saartaa taaj dahab saafi ah. 4
Wuxuu kaa baryay nolol, oo adna waad siisay isaga, Oo
waxaad siisay cimri dheer oo waaraya weligiis iyo weligiisba.
5 Ammaantiisu waxay ku weyn tahay xagga badbaadintaada,
Oo waxaad isaga saartaa murwad iyo haybad. 6 Waayo,
waxaad isaga ka dhigtaa mid weligiisba aad u barakaysan,
Oo waxaad ka dhigtaa inuu hortaada farxad kula reyreeyo.
7 Waayo, boqorku wuxuu isku halleeyaa Rabbiga, Oo
Ilaaha ugu sarreeya raxmaddiisa aawadeed isaga innaba
lama dhaqaajin doono. 8 Gacantaadu waxay heli doontaa
cadaawayaashaada oo dhan, Oo midigtaaduna waxay

heli doontaa kuwa ku neceb. 9 Oo markii aad cadhootid
waxaad iyaga ka dhigi doontaa sida foorno dab ah. Oo
Rabbigu wuxuu iyaga ku liqi doonaa cadhadiisa, Oo dab baa
gubi doona. 10 Midhahooda dhulkaad ka baabbi'inaysaa,
Farcankoodana binu-aadmiga dhexdiisa. 11 Waayo, iyagu
waxay ku talo jireen inay xumaan kugu sameeyaan, Oo
waxay hindiseen xeel ayan iyagu dhammayn karin. 12
Waayo, waxaad iyaga ka dhigi doontaa inay dib u jeestaan,
Oo xadhigga qaansadaadana waxaad ku diyaarin doontaa
wejigooda hortiisa. 13 Rabbiyow, adigu xooggaaga ku sarree,
Markaasaannu gabyi doonnaa, oo waxaannu ammaani
doonnaa itaalkaaga.

**22** Ilaahayow, Ilaahayow, maxaad ii dayrisay? Oo aad uga
fogaatay caawimaaddayda iyo hadalka hinraaggayga?
2 Ilaahayow, maalintii waan kuu qayshadaa, adiguse iima
jawaabtid, Oo habeennimadana waan qayliyaa oo ma nasto.
3 Laakiinse adigu quduus baad tahay, Oo kursigaaga waxaad
ka dhigtaa ammaanta reer binu Israa'iil. 4 Awowayaashayo
adigay isku kaa halleeyeen, Iyagu way isku kaa halleeyeen,
oo adna waad samatabbixisay. 5 Adigay kuu qayshadeen,
oo way samatabbexeen, Way isku kaa halleeyeen, oo
mana ay ceeboobin. 6 Laakiinse anigu waxaan ahay dixiri,
oo dad ma ahi, Waxaan ahay mid la caayo, oo dadku
quudhsado. 7 Oo kuwa i arka oo dhammu way igu qoslaan,
Bushimahay yuubaan, oo madaxay lulaan, iyagoo leh, 8
Rabbiguu isku halleeyey, ha samatabbixiyo, Bal isagu waa
kan ku faraxsane hadda ha samatabbixiyo. 9 Laakiinse
adigu waxaad tahay kii uurka iga soo bixiyey, Oo intaan
naasaha hooyaday nuugayay, waxaad iga dhigtay mid ku
aaminsan. 10 Aniga dushaadaa laygu soo tuuray markaan
uurka ka soo baxay, Xataa tan iyo intaan uurkii hooyaday ku
jiray, Ilaahaygaad ahayd. 11 Ha iga fogaan, waayo, dhib baa
soo dhow, Qof i caawiyaana ma jiro. 12 Waxaa i hareereeyey
dibiyo badan, Oo kuwii Baashaan oo xoogga badnaa ayaa
hareerahayga isku wareejiyey. 13 Afkooday iigu fureen,
Sidii libaax hamuunsan oo ciyaya. 14 Waxaan u shubmay
sidii biyo oo kale, Oo lafahaygii oo dhammuna xubnihii
way ka kala bexeen, Oo qalbigaygii wuxuu noqday sidii
shamac oo kale, Oo wuxuu ku dhex dhalaalay xiidmahayga.
15 Xooggaygii wuxuu u engegay sidii dheri burburkiisa oo
kale, Oo carrabkaygiina daamankayguu ku dhegay, Oo
waxaad i gelisay ciiddii dhimashada. 16 Waayo, waxaa i
hareereeyey eeyo, Oo waxaa hareerahayga isku wareejiyey
shirkii xumaanfalayaasha, Oo waxay iga mudeen gacmaha
iyo cagaha. 17 Lafahaygii oo dhan waan tirin karaa, Oo
iyagu way i fiiriyaan oo igu dhaygagaan, 18 Dharkayga
bay qaybsadaan, Oo maradaydana saami bay u ritaan.
19 Laakiinse, Rabbiyow, ha iga fogaan, Tageerehaygiiyow,
dhaqso ii caawi. 20 Naftayda ka samatabbixi seefta,
Noloshaydana ka samatabbixi xoogga eeyga. 21 Iga
badbaadi libaaxa afkiisa, Haah, xataa geesihii gisiyada
waad iiga jawaabtay. 22 Magacaaga waan u sheegi doonaa
walaalahay, Oo ururka dhexdiisa ayaan kugu ammaani
doonaa. 23 Kuwiinna Rabbiga ka cabsadow, ammaana
isaga, Farcanka Yacquubow, sharfa isaga, Oo kuwiinna
Israa'iil ka soo farcamayow, isaga ka wada cabsada. 24
Waayo, isagu ma quudhsan, mana karhin kan la dhibay
dhibkiisa, Oo wejigiisiina kama uu qarin isagii, Laakiinse
markuu u qayshaday ayuu maqlay. 25 Xaggaaga ayaa
ammaantaydu kaga imanaysaa shirka weyn dhexdiisa, Oo
nidarradayda waxaan ku bixinayaa kuwa isaga ka cabsada
hortooda. 26 Oo waxaa wax cuni doona oo ka dhergi doona
kuwa camalka qabow, Kuwa Rabbiga doondoonaa isagay
ammaani doonaan, Qalbigiinnu weligiis ha noolaado. 27
Dunida darafyadeeda oo dhammu waxay soo xusuusan
doonaan oo u soo jeesan doonaan Rabbiga. Oo qolooyinka
quruumaha oo dhammu waxay ku sujuudi doonaan hortaada.
28 Waayo, boqortooyada waxaa leh Rabbiga, Oo isagu waa
taliyihii quruumaha. 29 Dunida kuweeda buurbuuran oo
dhammu wax bay cuni oo Ilaah bay caabudi doonaan, Oo inta
ciidda gasha oo dhammuna hortiisay ku sujuudi doonaan,
Xataa kii aan naftiisa sii noolayn karin. 30 Farcan baa isaga
u adeegi doona, Oo Sayidka waxaa looga sheekayn doonaa
qarniga iman doona. 31 Oo iyagu way iman doonaan oo
waxay dadka dhalan doona u sheegi doonaan Xaqnimadiisa
iyo inuu sameeyeyba.

**23** Rabbigu waa adhijirka i jira; waxba u baahan maayo.
2 Wuxuu i fadhiisiyaa doog qoyan dhexdiis, Oo wuxuu
ii hoggaamiyaa biyaha deggan dhinacooda. 3 Naftayda
wuu soo celiyaa. Oo magiciisa aawadiis wuxuu igu hor
kacaa waddooyinka xaqnimada. 4 In kastoo aan ku dhex
socdo dooxada hooska dhimashada, Sharna ka baqi maayo,
waayo, waad ila jirtaa, Ushaada iyo hangoolkaaga ayaa
ii raaxeeya. 5 Cadaawayaashayda hortooda waxaad iigu
diyaarisaa miis, Oo saliid baad madaxayga ku subagtaa,
koobkayguna waa buuxdhaafaa. 6 Hubaal cimrigayga oo
dhan waxaa i raaci doona wanaag iyo naxariis, Oo weligay
guriga Rabbiga ayaan degganaan doonaa.

**24** Rabbigaa iska leh dhulka iyo waxa ka buuxa oo dhan,
Iyo dunida iyo kuwa degganba. 2 Waayo, isagaa
badaha dushooda ka aasaasay, Oo wuxuu ka dul dhisay
webiyaasha. 3 Bal yaa fuuli doona Rabbiga buurtiisa? Oo

bal yaa dhex istaagi doona meeshiisa quduuska ah? 4 Waa
kii gacmihiisu nadiifsan yihiin, oo qalbigiisu daahir yahay,
Oo aan naftiisa hawo been ah kor ugu qaadin, Oo aan
si khiyaano leh u dhaaran. 5 Kaasu wuxuu Rabbiga ka
heli doonaa barako, Ilaaha badbaadadiisana xaqnimo. 6
Kanu waxaa weeye qarnigii kuwa isaga doondoona, Oo waa
kuwa wejigaaga doondoona, Ilaaha Yacquubow. (Selaah) 7
Irdahow, madaxiinna kor u qaada, Oo albaabbada daa'imiska
ahow, kor ha laydiin qaado, Oo waxaa soo geli doona
Boqorka ammaanta. 8 Bal waa ayo Boqorka ammaantu?
Waa Rabbiga xoog iyo itaal badan, Waa Rabbiga dagaalka
ku xoog badan. 9 Irdahow, madaxiinna kor u qaada, Oo
albaabbada daa'imiska ahow, madaxiinna kor u qaada, Oo
waxaa soo geli doona Boqorka ammaanta. 10 Bal waa ayo
Boqorkan ammaantu? Waa Rabbiga ciidammada, Isaga
weeye Boqorka ammaantu. (Selaah)

**25** Rabbiyow, naftayda xaggaagaan kor ugu qaadaa.
2 Ilaahayow, adigaan isku kaa halleeyey, Haddaba
yaanan ceeboobin, Oo yaan cadaawayaashaydu ii faanin.
3 Kuwa adiga ku suga midkoodna ceeboobi maayo,
Laakiinse waxaa ceeboobi doona kuwa khiyaanada ku
macaamilooda sababla'aan. 4 Rabbiyow, jidadkaaga i tus,
Oo waddooyinkaagana i bar. 5 Runtaada igu hoggaami,
oo i bar, Waayo, waxaad tahay Ilaaha badbaadadayda, Oo
maalinta oo dhan adaan ku sugaa. 6 Rabbiyow, xusuuso
naxariistaada iyo raxmaddaada, Waayo, weligoodba way
jireen. 7 Ha xusuusan dembiyadii dhallinyaranimadayda iyo
xadgudubyadaydii, Laakiinse ii xusuuso sida raxmaddaadu
tahay, Iyo wanaaggaaga aawadiis, Rabbiyow. 8 Rabbigu
waa wanaagsan yahay, waana qumman yahay, Sidaas
daraaddeed wuxuu dembilayaasha ku hanuunin doonaa
jidka. 9 Kuwa camalka qabow wuxuu ku hanuunin doonaa
xaqa, Oo kuwa camalka qabow wuxuu bari doonaa jidkiisa.
10 Rabbiga waddooyinkiisa oo dhammu waxay raxmad iyo
run u yihiin Kuwa axdigiisa iyo markhaatifurkiisa xajiya.
11 Rabbiyow, dembigayga iga cafi magacaaga daraaddiis,
Waayo, aad buu u weyn yahay. 12 Bal waa ayo ninka
Rabbiga ka cabsadaa? Kaas wuxuu ku hanuunin doonaa
jidkii uu isagu doorto. 13 Naftiisu wanaag bay ku jiri doontaa,
Oo farcankiisuna wuxuu dhaxli doonaa dalka. 14 Rabbiga
taladiisa qarsoon waxay la jirtaa kuwa isaga ka cabsada,
Oo wuxuu iyaga tusi doonaa axdigiisa. 15 Weligayba
indhahaygu waxay u jeedaan xagga Rabbiga, Waayo, wuxuu
cagahayga ka bixin doonaa dabinka. 16 Bal xaggayga
u soo jeeso, oo ii naxariiso, Waayo, waan cidloobay, oo
dhib baa i haysa. 17 Dhibaatooyinka qalbigaygu way sii
ballaadheen, Cidhiidhigayga iga bixi. 18 Bal fiiri dhibkayga
iyo qaxarkayga, Oo dembiyadayda oo dhan iga cafi. 19 Bal
fiiri cadaawayaashayda, waayo, way badan yihiin, Oo waxay
igu neceb yihiin nacayb dulmi miidhan ah. 20 Naftayda
dhawr, oo i samatabbixi, Oo yaanan ceeboobin, waayo,
waan isku kaa halleeyaa. 21 Daacadnimo iyo qummanaanu
ha i dhawreen, Waayo, adaan ku sugaa. 22 Ilaahow, reer
binu Israa'iil ka samatabbixi Dhibaatooyinkooda oo dhan.

**26** Rabbiyow, i xukun, waayo, waxaan ku socday
daacadnimadayda, Oo weliba waxaan Rabbiga isugu
halleeyey rogrogmashola'aan. 2 Rabbiyow, i imtixaan, oo
i tijaabi, Oo uurkayga iyo qalbigaygana baadh. 3 Waayo,
raxmaddaadu waxay taal indhahayga hortooda, Oo waxaan
ku socday runtaada. 4 Lama aan fadhiisan waxmatarayaal,
Oo kuwa isyeelyeelana gudaha la geli maayo. 5 Waan
necbahay ururka xumaanfalayaasha, Oo kuwa sharka
lehna la fadhiisan maayo. 6 Gacmahayga waxaan ku
maydhan doonaa eedla'aanta, Markaasaan ku wareegi
doonaa meeshaada allabariga, Rabbiyow, 7 Si aan codka
mahadnaqidda dadka u maqashiiyo, Oo aan uga sheekeeyo
shuqulladaada yaabka leh oo dhan. 8 Rabbiyow, rugta
gurigaaga waan jeclahay, Iyo meesha ammaantaadu joogto.
9 Naftayda ha la ururin dembilayaal, Noloshaydana ha la
ururin dhiigyocabyada, 10 Gacmahooda belaayadu ku jirto,
Gacantooda midigna laaluush ka buuxo. 11 Laakiinse anigu
waxaan ku socon doonaa daacadnimadayda, Haddaba i
madaxfuro, oo ii naxariiso. 12 Cagtaydu waxay ku taagan
tahay meel siman, Oo Rabbigaan ku ammaani doonaa
shirarka dhexdooda.

**27** Rabbigu waa nuurkayga iyo badbaadadayda, bal yaan
ka cabsadaa? Oo Rabbigu waa xoogga noloshayda, bal
yaan ka baqaa? 2 Markii xumaanfalayaashu iigu yimaadeen
inay hilibkayga cunaan, Kuwaasoo ah cadaawayaashayda
iyo colkayga, way turunturoodeen, wayna dheceen. 3
In kastoo ciidan col ah i ag dego, Qalbigaygu cabsan
maayo, In kastoo dagaal igu soo kaco, Xataa markaas waan
kalsoonaanayaa. 4 Wax keliya ayaan Rabbiga ka baryay,
oo taas aad baan u doonayaa, Waana inaan cimrigayga
oo dhan dhex degganaado guriga Rabbiga, Oo aan fiiriyo
Rabbiga quruxdiisa, oo aan wax ku baryo macbudkiisa.
5 Waayo, isagu maalinta dhibta wuxuu igu qarin doonaa
teendhadiisa, Oo meesha qarsoon oo taambuuggiisa ayuu
igu xasayn doonaa, Kor buu ii qaadi doonaa oo dhagax
weyn buu i saari doonaa. 6 Imminka waxaa madaxayga
laga sarraysiin doonaa cadaawayaashayda igu wareegsan,
Oo waxaan taambuugga Rabbiga ku dhex bixin doonaa

allabari dhawaaq farxadeed leh, Waan gabyi doonaa, haah,
ammaan baan Rabbiga ugu gabyi doonaa. 7 Rabbiyow,
markaan codkayga ku qayliyo, i maqal, Weliba ii naxariiso,
oo ii jawaab. 8 Markaad tidhi, Wejigayga doondoona,
ayaa qalbigaygu wuxuu kugu yidhi, Rabbiyow, wejigaaga
waan doondoonayaa. 9 Ilaaha badbaadadaydow, wejigaaga
ha iga qarin, Anoo addoonkaaga ah cadho ha igu eryin,
Caawimaad baad ii ahayde, Ha i xoorin, hana i dayrin. 10
Waayo, aabbahay iyo hooyaday way i dayriyeen, Laakiinse
Rabbigaa i qaadan doona. 11 Rabbiyow, cadaawayaashayda
daraaddood Jidkaaga i bar, Oo igu hoggaami waddo
bannaan. 12 Oo gacanta ha ii gelin cadaawayaashayda,
Waayo, waxaa igu kacay markhaatiyaal been ah iyo kuwa
nacweynaanta ku hadla. 13 Waan itaal darnaan lahaa
haddaanan rumaysnayn Inaan wanaagga Rabbiga ku arkayo
dalka kuwa nool. 14 Rabbiga sug, Adkayso, oo qalbigaagu
ha dhiirranaado, Haah, Rabbiga sug.

**28** Rabbiyow, adigaan kuu qayshan doonaa, Dhagaxayga
weynow, ha iska kay dhega tirin, Waaba intaas oo
haddaad iga aamusto, Aan noqdaa sida kuwa yamayska hoos
ugu dhaadhaca. 2 Maqal codka baryootankayga markaan
kuu qayshado, Oo aan gacmahayga u soo taago xagga
meeshaada quduuska ah. 3 Ha ila jiidin kuwa sharka leh,
Iyo xumaanfalayaasha Oo deriskooda nabadda kula hadla,
Laakiinse belaayadu qalbigooda ku jirto. 4 Iyaga u abaalmari
sida shuqulkoodu yahay, iyo sida ay xumaanta falimahoodu
tahay, Iyaga u abaalmari sida shuqulka gacmahoodu yahay,
Oo waxa ay galabsadaan sii. 5 Iyaga wuu dumin doonaa,
mana uu dhisi doono mar dambe, Maxaa yeelay, kama
ay fikirin Rabbiga shuqulladiisii Iyo hawshii gacmihiisa
toona. 6 Mahad waxaa leh Rabbiga, Maxaa yeelay, codkii
baryootankayguu maqlay. 7 Rabbigu waa xooggayga iyo
gaashaankayga, Qalbigaygu isaguu isku halleeyey, oo waa
lay caawiyey, Sidaas daraaddeed qalbigaygu aad iyo aad
buu u reyreeyey, Oo gabaygaygaan isaga ku ammaani
doonaa. 8 Rabbigu wuxuu dadkiisa u yahay xoog, Oo
kiisa subkanna wuxuu u yahay qalcad lagu badbaado. 9
Dadkaaga badbaadi, oo dhaxalkaagana barakee, Oo weliba
quudi, oo weligaaba kor u hay.

**29** Kuwiinna carruurta Ilaah ahow, Rabbiga ammaana,
Rabbiga ka sheega ammaan iyo xoog. 2 Rabbiga
ku ammaana ammaanta magiciisu mudan yahay, Rabbiga
ku caabuda quruxda quduuska ah. 3 Rabbiga codkiisu
wuxuu dul joogaa biyaha, Ilaaha ammaantu wuu onkodaa,
Oo xataa Rabbigu wuxuu ka kor onkodaa biyo badan. 4
Rabbiga codkiisu waa xoog badan yahay, Rabbiga codkiisu
waa haybad badan yahay. 5 Rabbiga codkiisu wuxuu
jebiyaa geedaha kedarka ah, Haah, oo Rabbigu wuxuu kala
jebjebiyaa geedaha kedarka ah oo Lubnaan. 6 Oo weliba
wuxuu iyaga ka dhigaa inay u boodboodaan sida weyl oo
kale, Lubnaan iyo Siryonba wuxuu ka dhigaa sida gisi yar. 7
Rabbiga codkiisu wuxuu googooyaa ololka dabka. 8 Rabbiga
codkiisu wuxuu ruxruxaa cidlada, Rabbigu wuxuu ruxruxaa
cidlada Qaadeesh. 9 Rabbiga codkiisu wuxuu dhaliyaa
deerooyinka, Oo kayntana caleemaha wuu ka daadiyaa, Oo
wax kasta oo macbudkiisa ku jiraana waxay yidhaahdaan,
Ammaan. 10 Rabbigu wuxuu dul fadhiyaa daadka, Haah, oo
Rabbigu wuxuu weligiisba u fadhiyaa sida boqor oo kale. 11
Rabbigu dadkiisuu xoogayn doonaa, Oo Rabbigu nabad buu
dadkiisa ku barakayn doonaa.

**30** Rabbiyow, waan ku sarraysiinayaa, waayo, kor
baad iga yeeshay, Oo weliba igama aad dhigin in
cadaawayaashaydu ii faanaan. 2 Rabbiyow, Ilaahayow,
Waan kuu qayshaday oo adna waad i bogsiisay. 3 Rabbiyow,
waxaad naftaydii kor uga qaadday She'ool, Oo waad i sii
noolaysay si aanan yamayska ugu dhicin. **(Sheol h7585)** 4
Quduusiintiisoy, Rabbiga ammaan ugu gabya, Oo mahad
ku naqa magiciisa quduuska ah. 5 Waayo, cadhadiisu
waa daqiiqad keliya, Laakiinse raallinimadiisu waa cimriga,
Habeenka waxaa jirta oohin, Laakiinse aroorta farxad baa
timaada. 6 Aniguse intaan barwaaqaysnaa waxaan idhi,
Weligay dhaqdhaqaaqi maayo. 7 Rabbiyow, raallinimadaada
aawadeed ayaad buurtayda ka dhigtay inay si adag u
taagnaato, Wejigaagaad qarisay, oo anna waan argaggaxay.
8 Rabbiyow, adigaan kuu soo qayshaday, Oo baryootankaygii
waxaan gaadhsiiyey Rabbiga. 9 Bal markaan yamayska ku
dego, maxaa faa'iido ah oo dhiiggayga ku jirta? Ma ciiddaa ku
ammaanaysa? Oo ma runtaaday sheegaysaa? 10 Rabbiyow,
i maqal oo ii naxariiso, Rabbiyow, kaalmeeyahayga ahow. 11
Baroortaydii waxaad iigu beddeshay cayaar, Oo dharkaygii
joonyadaha ahaana waad iga furtay, oo waxaad ii guntisay
farxad, 12 Taasuna waa si nafsaddaydu ay ammaan kuugu
gabaydo, oo aanay u aamusin. Rabbiyow, Ilaahayow,
weligayba waan kugu mahadnaqayaa.

**31** Rabbiyow, adigaan isku kaa halleeyaa, yaanan
weligayba ceeboobin, Oo xaqnimadaada igu
samatabbixi. 2 Dhegtaada ii soo dhig, oo dhaqso ii
samatabbixi, Dhagax weyn oo xoog leh ii ahow, iyo guri
laysku daafaco si aad ii badbaadisid. 3 Waayo, waxaad
tahay dhagax weyn oo ii gabbaad ah iyo qalcaddayda,
Haddaba magacaaga daraaddiis ii hoggaami oo ii hanuuni.
4 Oo iga bixi shabagga dabinka ah oo ay qarsoodiga iigu

dhigeen, Waayo, waxaad tahay qalcaddayda. 5 Gacantaada
ayaan ruuxayga u dhiibayaa, Waayo, waad i soo furatay,
Rabbiyow, Ilaaha runta ahow. 6 Waan neceb ahay kuwa
hawada beenta ah ka fikira, Laakiinse Rabbigaan isku
halleeyaa. 7 Naxariistaada waan ku farxi doonaa, waanan
ku rayrayn doonaa, Waayo, dhibaatadii igu dhacday waad
aragtay, Waanad ogayd qaxarka naftaydu ku jirtay, 8 Oo
weliba iguma aad xidhin gacantii cadowga, Oo cagtayda
waxaad taagtay meel ballaadhan. 9 Rabbiyow, ii naxariiso,
waayo, cidhiidhi baan ku jiraa, Oo murug baan la il go'aa,
oo naftayda iyo jidhkayguba way taag darnaadaan. 10
Waayo, noloshaydu waxay ku dhammaatay caloolxumo,
cimrigayguna taahid, Oo dembigayga daraaddiis ayaa
xooggaygii ii gabay, lafahaygiina way wada kharribmeen. 11
Cadaawayaashayda oo dhan daraaddood ayaan waxaan
noqday mid ceebaysan, Xataa deriskayga aad iyo aad baan
ugu hor ceeboobay, oo kuwa i yaqaanna way iga cabsadeen,
Oo xataa kuwii dibadda igu arkay way iga carareen. 12 Sida
qof dhintay oo laga samray ayaa layska kay illoobay, Oo
waxaan ahay sida weel jabay. 13 Waayo, waxaan maqlay
kuwo badan oo caytamaya, Iyo cabsi dhan kasta igaga
wareegsan, Oo intay ii wada tashadeen, Ayay waxay ku
arrinsadeen inay nafta iga qaadaan. 14 Laakiinse Rabbiyow,
adigaan isku kaa halleeyey, Oo waxaan idhi, Waxaad tahay
Ilaahay. 15 Wakhtigaygu gacantaaduu ku jiraa, Haddaba iga
samatabbixi gacanta cadaawayaashayda, iyo weliba kuwa i
silciya gacantooda. 16 Wejigaaga anoo addoonkaaga ah igu
iftiimi, Oo igu badbaadi raxmaddaada. 17 Rabbiyow, yaanan
ceeboobin, waayo, adigaan kuu qayshaday, Kuwa sharka
lahu ha ceeboobeen, oo She'ool ha ku dhex aamuseen.
**(Sheol h7585)** 18 Ha carrab beeleen kuwa beenta sheegaa, Oo
kan xaqa ah si qallafsan wax uga sheega, Iyagoo kibir iyo
quudhsasho leh. 19 Wanaaggaagu weynaan badanaa, kan
aad u kaydisay kuwa kaa cabsada, Oo weliba aad binu-
aadmiga hortiisa ugu diyaarisay kuwa isku kaa halleeya.
20 Dadka sirqoolladiisa waxaad iyaga kaga qarinaysaa
joogistaada qarsoon, Oo carrabka dirirtiisana waxaad iyaga
kaga qarinaysaa taambuug. 21 Mahad waxaa leh Rabbiga,
Waayo, wuxuu raxmaddiisa yaabka leh igu tusay magaalo
xoog weyn. 22 Laakiinse anigu waxaan degdeg ku idhi,
Indhahaaga hortooda waan ka go'ay, Habase yeeshee, codkii
baryootankayga waad maqashay markii aan kuu qayshaday.
23 Quduusiintiisa oo dhammay, Rabbiga jeclaada, Rabbigu
wuu ilaaliyaa kuwa aaminka ah, Kan waxa kibirka ah falase
aad iyo aad buu u abaalmariyaa. 24 Kuwiinna Rabbiga wax
ka rajaynaya oo dhammow, Adkaysta, oo qalbigiinnu ha
dhiirranaado.

**32** Waxaa barakaysan kii xadgudubkiisa la cafiyey,
oo dembigiisa la daboolay. 2 Waxaa barakaysan
ninkii aanu Rabbigu dembi ku tirin, Oo ruuxiisa aanay
khiyaano ku jirin. 3 Markii aan iska aamusay, lafahaygii
way gaboobeen, Maxaa yeelay, maalintii oo dhan baan
cabaadayay. 4 Waayo, habeen iyo maalinba gacantaadu
way igu cuslayd, Oo qoyaankaygii wuxuu u beddelmay
sidii engegga diraacda. (Selaah) 5 Dembigaygii adigaan
kuu qirtay, oo xumaantaydiina ma aan qarin, Waxaan idhi,
Xadgudubkayga waxaan u qiranayaa Rabbiga, Oo adna
waad iga cafiday xumaanta dembigayga. (Selaah) 6 Taas
daraaddeed mid kastoo cibaado lahu ha ku soo baryo
wakhti lagu heli karo, Hubaal markii biyaha badanu dhulka
qarqiyaan, isaga sooma ay gaadhi doonaan. 7 Waxaad tahay
meeshaan ku dhuunto, oo dhib baad iga ilaalin doontaa,
Oo waxaad igu wareejin doontaa gabayadii samatabbixinta.
(Selaah) 8 Waan ku hanuunin doonaa oo waxaan ku bari
doonaa jidka aad ku socon lahayd, Oo waxaan kula talin
doonaa iyadoo ay ishaydu kula jirto. 9 Ha noqonina sida
faraska ama baqalka aan garaadka lahayn, Kuwaasoo
hoggaankoodu yahay xakame iyo birtiisa in lagu hayo,
Haddii kalese innaba kuu soo dhowaan maayaan. 10 Kii shar
leh waxaa ku dhici doona waxyaalo badan oo murug leh,
Laakiinse kii Rabbiga isku halleeya waxaa ku wareegsanaan
doona naxariis. 11 Kuwiinna xaqa ahow, Rabbiga ku farxa
oo reyreeya, Oo inta qalbigoodu qumman yahayow, kulligiin
farxad la dhawaaqa.

**33** Kuwiinna xaqa ahow, Rabbiga ku reyreeya, Waayo,
kuwa qumman ammaan baa u habboon. 2 Rabbiga
ugu mahadnaqa kataarad, Oo isaga ammaan ugu heesa
idinkoo ka dhawaajinaya shareerad toban xadhig leh. 3
Gabay cusub isaga ugu gabya, Oo si farsamo wanaagsan
ugaga dhawaajiya cod weyn. 4 Waayo, Rabbiga eraygiisu
waa toosan yahay, Oo shuqulkiisa oo dhanna waxaa lagu
sameeyey aaminnimo. 5 Wuxuu jecel yahay xaqnimo iyo
caddaalad, Dhulka waxaa ka buuxda Rabbiga raxmaddiisa.
6 Samooyinka waxaa lagu sameeyey Rabbiga eraygiisa,
Oo guutooyinkooda oo dhanna waxaa lagu uumay neefta
afkiisa. 7 Isagu biyaha badda intuu isku ururiyo ayuu wuxuu
ka dhigaa sidii taallo oo kale, Oo moolalka dhaadheerna
wuxuu dhex dhigaa maqsinno. 8 Inta dhulka joogta oo
dhammu Rabbiga ha ka cabsadeen, Inta dunida deggan
oo dhammu isaga ha ka baqeen. 9 Waayo, isagu wuu
hadlay, wayna noqotay, Oo wuu amray, wayna adkaatay.
10 Rabbigu quruumaha taladooda wuu baabbi'iyaa, Oo
dadyowga fikirradoodana wuu buriyaa. 11 Laakiinse Rabbiga

taladiisu weligeedba way adkaataa, Oo fikirrada qalbigiisuna
waxay adkaadaan tan iyo ka ab ka ab. 12 Waxaa barakaysan
quruunta Ilaaheedu Rabbiga yahay, Taasoo ah dadka uu
isagu u doortay dhaxalkiisa. 13 Rabbigu samaduu wax ka
soo fiiriyaa, Oo wuxuu arkaa binu-aadmiga oo dhan, 14 Oo
meesha isaga rugta u ah Ayuu wuxuu ka soo fiiriyaa kuwa
dhulka deggan oo dhan, 15 Waa isaga kan qalbiyadooda
oo dhan sameeya, Oo shuqulladooda oo dhan u wada
fiirsada. 16 Ma jiro boqor ku badbaada ciidan weyn, Ninkii
xoog badanuna iskuma samatabbixiyo xoog badan. 17
Faras waa waxmatare in badbaado laysugu halleeyo, Oo
weliba ninnaba kuma samatabbixiyo xooggiisa badan. 18
Bal eega, Rabbiga ishiisu waxay la jirtaa kuwa isaga ka
cabsada, Waana kuwa naxariistiisa rajeeya, 19 Inuu naftooda
dhimashada ka samatabbixiyo, Iyo inuu wakhtiga abaartaa
sii nooleeyo iyaga. 20 Nafteennu waxay sugtay Rabbiga,
Waayo, isagu wuxuu inoo yahay caawimaad iyo gaashaan.
21 Haddaba qalbigeennu isaguu ku rayrayn doonaa, Maxaa
yeelay, innagu waxaynu isku halleeynay magiciisa quduuska
ah. 22 Rabbiyow, naxariistaadu ha noogu soo degto, Sidii
aannu kaa rajaynay.

34 Wakhti kasta ayaan Rabbiga ammaani doonaa, Oo
had iyo goorba ammaantiisu afkaygay ku jiri doontaa.
2 Naftaydu waxay ku faani doontaa Rabbiga, Oo waxaa
maqli doona kuwa camalka qabow, oo weliba way ku farxi
doonaan. 3 Rabbiga ila weyneeya, Oo aynu magiciisa wada
sarraysiinno. 4 Rabbigaan doondoonay, oo isna wuu ii
jawaabay, Oo wuxuu iga samatabbixiyey waxyaalihii aan
ka cabsaday oo dhan. 5 Iyagu waxay fiiriyeen isaga, oo
way iftiimeen, Oo wejigooduna weligood ceeboobi maayo.
6 Ninkan miskiinka ahu wuu qayshaday, oo Rabbiguna
wuu maqlay, Oo wuxuu ka badbaadshay dhibaatooyinkiisii
oo dhan. 7 Malaa'igta Rabbigu waxay hareeraysaa kuwa
isaga ka cabsada, Oo weliba way samatabbixisaa. 8
Bal dhadhamiya oo arka in Rabbigu wanaagsan yahay,
Waxaa barakaysan ninkii isaga isku halleeya. 9 Kuwiinna
quduusiintiisa ahow; Rabbiga ka cabsada, Waayo, kuwa
isaga ka cabsadaa waxba uma baahna. 10 Aaranka libaaxa
wax baa ka dhimman, wayna gaajoodaan, Laakiinse kuwa
Rabbiga doondoonaa wax wanaagsan uma baahnaan
doonaan. 11 Carruurtoy, kaalaya oo i dhegaysta, Oo anna
waxaan idin bari doonaa Rabbiga ka cabsashadiisa. 12
Bal waa ayo ninka nolol jecel, Oo cimriga dheer doonayaa,
Si uu wanaag u arko? 13 Carrabkaaga shar ka jooji,
Bushimahaagana inay khiyaano ku hadlaan ka ilaali. 14
Shar ka leexo, oo wanaag samee, Nabad doondoon, oo
raacdayso iyada. 15 Rabbiga indhihiisu waxay fiiriyaan kuwa
xaqa ah, Oo dhegihiisuna waxay u furan yihiin baryadooda.
16 Wejiga Rabbigu waa ka gees kuwa sharka sameeya Inuu
iyaga xusuustooda dhulka ka baabbi'iyo. 17 Kuwa xaqa ahu
way qayshadeen, oo Rabbigaa maqlay, Oo wuxuu iyaga ka
samatabbixiyey dhibaatooyinkoodii oo dhan. 18 Rabbigu waa
u dhow yahay kuwa dembigooda ka caloolyaysan, Oo kuwa
ruuxoodu qoomamaysan yahayna wuu badbaadiyaa. 19 Kan
xaqa ah dhibaatooyinkiisu way tiro badan yihiin, Laakiinse
Rabbigu waa ka samatabbixiyaa dhammaantoodba. 20
Isagu wuxuu dhawraa lafihiisa oo dhan, Oo middoodna ma
jabna. 21 Xumaan baa dili doonta kuwa sharka leh, Oo kuwa
neceb kan xaqa ahna waa la eedayn doonaa. 22 Rabbigu
nafta addoommadiisa wuu soo furtaa, Oo kuwa isaga isku
halleeya, midkoodna lama eedayn doono.

35 Rabbiyow, la dirir kuwa ila dirira, Oo la dagaallan kuwa
ila dagaallama. 2 Gaashaan iyo gabbaad qaado. Oo
caawimaaddayda daraaddeed u istaag. 3 Waran la soo bax,
oo kuwa i eryanaya jidka ka goo, Oo naftayda waxaad ku
tidhaahdaa, Anigu waxaan ahay badbaadadaada. 4 Kuwa
naftayda doondoonayaa ha ceeboobeen, oo sharafdarro ha
ku soo degto, Oo kuwa waxyeelladayda u arrinsanayana
dib ha loo celiyo, oo ha wareereen. 5 Ha noqdeen sida
buunshe dabaysha hor socda, Oo malaa'igta Rabbigu
horay u sii kaxaynayso. 6 Jidkoodu ha noqdo gudcur iyo
meel simbiriirixo leh, Oo malaa'igta Rabbigu ha eryato. 7
Waayo, iyagu sababla'aan bay dabin god iigu qarsheen,
Oo sababla'aan bay naftayda god ugu qodeen. 8 Isagoo
aan iska jirin halligaadu ha ku soo degto, Oo dabinkiisuu
qariyey isaga ha qabsado, Oo isagu halligaaddaas ha ku
dhaco. 9 Oo naftayduna Rabbigay aad ugu farxi doontaa,
Oo waxay ku rayrayn doontaa badbaadintiisa. 10 Lafahayga
oo dhammu waxay odhan doonaan, Rabbiyow, bal yaa kula
mid ah? Kaaga kii miskiin ah ka samatabbixiya kii isaga
ka xoog badan, Haah, oo kii miskiin ah iyo kan baahanba
ka samatabbixiya kii dhaca. 11 Waxaa kaca markhaatiyaal
xaqdarro ah, Oo waxay i weyddiiyaan waxyaalo aanan ogayn.
12 Wanaag xumaan bay iigaga abaalgudaan Oo naftayda
way gacal tiraan. 13 Laakiinse markay bukeen, dharkaygu
wuxuu ahaa joonyado, Oo naftaydana soon baan ku dhibay,
Oo tukashadayduna laabtayday ku soo noqotay. 14 Anigu
waxaan u qaatay sidii isagoo ah saaxiibkay ama walaalkay,
Oo waxaan la foororsaday baroorasho sida mid hooyadiis
u baroorta. 15 Laakiinse anigu markaan turunturooday
ayay reyreeyeen, oo way isa soo wada urursadeen, Oo
waxmatarayaashii ayaa dhammaantood ii wada shiray, oo

anna ma aan ogayn innaba, Way i dildillaacsadeen oo
imana ay dayn. **16** Sida labawejiilayaashu diyaafado uga
dhex majaajiloodaan Ayay igu ilko jirriqsadeen. **17** Sayidow,
ilaa goormaad sii fiirinaysaa? Naftayda halligaaddooda ka
badbaadi, Noloshaydana libaaxyada ka badbaadi. **18** Waxaan
kaaga mahadnaqi doonaa shirka weyn dhexdiisa, Oo dad
fara badan dhexdooda ayaan kugu ammaani doonaa. **19**
Kuwa sida qaladka ah cadowga iigu ahi, yaanay igu rayrayn,
Oo kuwa sababla'aanta ii necebuna yaanay isu il jebin. **20**
Waayo, iyagu nabad kuma hadlaan, Laakiinse waxay hadallo
khiyaano miidhan ah ugu hindisaan kuwa dalka ku xasilloon.
**21** Afkoodii aad bay iigu fureen, Oo waxay yidhaahdeen,
Ahaa, ahaa, annagaa indhahayaga ku aragnay. **22** Rabbiyow,
adigu waad aragtay, haddaba ha iska aamusin, Sayidow,
ha iga fogaan. **23** Sara joogso, oo garsooriddayda u toos,
Oo dacwadayda dhegayso, Ilaahayow, Sayidkayow. **24**
Rabbiyow, Ilaahayow, igu xukun sida ay xaqnimadaadu
tahay, Oo yaanay igu rayrayn. **25** Yaanay qalbigooda iska
odhan, Ahaa, sidaasaannu doonaynaa, Yaanay odhan, Isagii
waannu liqnay. **26** Kuwa waxyeelladayda ku reyreeyaa ha
wada ceeboobeen oo ha isku wareereen dhammaantood,
Oo iyagu ha huwadeen ceeb iyo sharafdarro kuwa iska
kay weynaysiiyaa. **27** Kuwa xaqnimadayda jecelu farxad
ha ku dhawaaqeen, oo ha farxeen, Oo had iyo goorba ha
yidhaahdeen, Rabbiga ha la weyneeyo, Waayo, isagu wuxuu
ku farxaa barwaaqada addoonkiisa. **28** Oo maalinta oo dhan
carrabkaygu wuxuu ka hadli doonaa Xaqnimadaada iyo
ammaantaadaba.

**36** Kii shar leh xadgudubkiisu wuxuu qalbigiisa ka
yidhaahdaa, Ilaah ka cabsashadiisu indhahayga ma
hor taal. **2** Waayo, wuu isfaaniyaa inaan dembigiisa la garan
karin Oo aan la nebcaanayn. **3** Erayada afkiisu waa xumaan
iyo khiyaano, Oo inuu caqliyaysto iyo inuu wax wanaagsan
sameeyoba wuu iska daayay. **4** Wuxuu sariirtiisa ku hindisaa
xumaan, Oo wuxuu joogsadaa jid aan wanaagsanayn,
Oo weliba sharka ma naco. **5** Rabbiyow, raxmaddaadu
samooyinkay ku jirtaa, Aaminnimadaaduna daruurahay
gaadhaa. **6** Xaqnimadaadu waa sida buuraha Ilaah, Oo
xukummadaaduna waa mool dheer, Rabbiyow, waxaad nabad
gelisaa dadka iyo duunyadaba. **7** Ilaahow, raxmaddaadu
qaalisanaa! Oo binu-aadmiguna wuxuu magangalaa hooska
baalashaada. **8** Aad bay uga dhergi doonaan barwaaqada
gurigaaga, Oo waxaad iyaga ka waraabin doontaa webiga
farxaddaada. **9** Waayo, isha noloshu aday kula jirtaa, Oo
iftiinkaagaannu iftiin ku aragnaa. **10** Raxmaddaada ugu sii
wad kuwa ku yaqaan, Oo xaqnimadaadana kuwa qalbigoodu
qumman yahay. **11** Cagta kuwa kibirsan yaanay ii iman,
Oo kuwa sharka leh gacantooduna yaanay i eryin. **12**
Xumaanfalayaashu halkaasay ku dhaceen, Iyaga hoos baa
loo riday, oo mana ay kari doonaan inay mar dambe soo
kacaan.

**37** Ha isku dhibin xumaanfalayaasha aawadood, Hana
uga hinaasin kuwa xaqdarrada sameeya. **2** Waayo,
iyaga haddiiba waxaa loo jari doonaa sida cawska oo kale,
Oo waxay u engegi doonaan sida geedo yaryar oo qoyan. **3**
Rabbiga isku hallee oo wanaag samee, Oo sidaasaad dalka
ku degganaan doontaa, oo ammaan baad ku daaqi doontaa.
**4** Haddaba Rabbiga ku farax, Oo wuxuu ku siin doonaa waxa
qalbigaagu doonayo. **5** Jidkaaga Rabbiga ku aamin, Isagana
isku hallee, wuuna samaynayaaye. **6** Xaqnimadaada wuxuu
u soo bixin doonaa sida nuurka oo kale, Gartaadana sida
duhurka oo kale. **7** Rabbiga ku hor xasilloonow, oo isaga
samir ku sug, Oo ha isku dhibin kii jidkiisa ku barwaaqaysan
Iyo ninkii hindisooyin shar ah sameeya toona. **8** Cadhada
ka joogso, oo dhirifka ka tag, Hana isku dhibin inaad shar
samaysid. **9** Waayo, xumaanfalayaashu way go'i doonaan,
Laakiinse kuwa Rabbiga sugaa dalkay dhaxli doonaan. **10**
Wakhti yar dabadeedna kan sharka lahu ma jiri doono, Bal
meeshiisa aad baad ugu fiirsan doontaa, oo isna ma jiri
doono. **11** Laakiinse kuwa camalka qabow dalkay dhaxli
doonaan, Oo waxay ku farxi doonaan nabad badan. **12**
Kan sharka lahu wuxuu shirqool u dhigaa kan xaqa ah,
Oo isaga ayuu u ilko jirriqsadaa. **13** Oo Sayidku wuu ku
qosli doonaa isaga, Waayo, wuxuu arkaa in maalintiisu
soo dhowaanayso. **14** Kuwa sharka lahu waxay la bexeen
seeftoodii, qaansadoodiina way xooteen, Si ay miskiinka iyo
kan baahan hoos ugu tuuraan, Oo ay laayaan kuwa jidkooda
ku qumman. **15** Seeftoodu waxay mudi doontaa wadnahooda,
Oo qaansooyinkooduna way kala jebi doonaan. **16** Inta yar
oo mid xaq ahu haystaa Way ka sii wanaagsan tahay kuwa
sharka leh maalkooda badan. **17** Waayo, kuwa sharka leh
gacmahoodu way jebi doonaan, Laakiinse Rabbigu kuwa
xaqa ah wuu tiiriyaa. **18** Rabbigu wuu yaqaan kuwa kaamilka
ah cimrigooda, Oo dhaxalkooduna weligiisba wuu waarayaa.
**19** Iyagu ma ceeboobi doonaan wakhtiga shar jiro, Oo
wakhtiga abaaru dhacdona way dhergi doonaan. **20** Laakiinse
kuwa sharka lahu way halligmi doonaan, Cadaawayaasha
Rabbiguna waxay ahaan doonaan sida inta wanaagsan oo
doogga, Way baabbi'i doonaan, sida qiiqa oo kale way u
baabbi'i doonaan. **21** Kii shar lahu wax buu amaahdaa, mana
bixiyo mar dambe, Laakiinse kan xaqa ahu wuu naxariistaa,
waxna wuu bixiyaa. **22** Oo kuwuu barakeeyo ayaa dalka
dhaxli doona, Laakiinse kuwuu habaaraa way go'i doonaan.

23 Dadka socodkiisa waxaa hagaajiya Rabbiga, Oo jidkiisuu ku farxaa. 24 Oo in kastoo uu kufo, haddana ma wada dhici doono, Waayo, Rabbiga ayaa gacantiisa ku tiiriya. 25 Waan dhallin yaraan jiray, oo haatanna waan gaboobay, Oo weligay ma arag mid xaq ah oo la dayriyey, Ama carruurtiisa oo cunto tuugsanaysa. 26 Maalinta oo dhan wuu naxariistaa oo wax buu amaahiyaa, Oo carruurtiisuna way barakaysan yihiin. 27 Sharka ka fogow, oo wanaag samee, Oo weligaa baad degganaan doontaa. 28 Waayo, Rabbigu wuxuu jecel yahay caddaaladda, Mana uu dayrsho quduusiintiisa, Laakiinse iyaga weligoodba waa la ilaashaa, Illowse kuwa sharka leh carruurtoodu way go'i doonaan. 29 Kuwa xaqa ahu dalkay dhaxli doonaan, Oo weligoodna way dhex degganaan doonaan. 30 Kan xaqa ah afkiisu wuxuu ka hadlaa xigmadda, Carrabkiisuna wuxuu ku hadlaa caddaaladda. 31 Oo Ilaahiisa sharcigiisu waa ku jiraa qalbigiisa, Oo tallaabooyinkiisana midnaba dib uma simbiriirixan doonto. 32 Kan sharka lahu wuxuu fiiriyaa kan xaqa ah, Oo wuxuu doondoonaa inuu isaga dilo. 33 Rabbigu isaga gacantiisa ku dayn maayo, Oo eedayn maayo marka la xukumo isaga. 34 Rabbiga sug, oo jidkiisa xaji, Oo wuxuu kuu sara marin doonaa inaad dalka dhaxasho, Waad arki doontaa marka kuwa sharka lahu go'aan. 35 Waxaan arkay ku shar leh oo dulun badan, Oo isu kala bixiya sida geed cagaar ah oo dhulkiisii ka baxay. 36 Laakiin waa la ag maray, oo isagii lama arag, Oo waan doondoonay, laakiinse waa la waayay. 37 Bal fiiri ninka kaamilka ah, oo bal eeg, kan qumman, Waayo, ninkaas ugu dambaystiisu waa nabad. 38 Laakiinse kuwa xadgudbaa dhammaantood wadajir bay u baabbi'i doonaan, Oo kuwa sharka lahuna ugu dambaystooda way go'i doonaan. 39 Kuwa xaqa ahse badbaadadoodu waa xagga Rabbiga, Oo wakhtiga dhibaatada isagu waa qalcaddooda. 40 Oo Rabbigu iyaguu caawiyaa, wuuna samatabbixiyaa, Oo wuxuu iyaga ka samatabbixiyaa kuwa sharka leh, wuuna badbaadiyaa, Maxaa yeelay, isagay magangaleen.

**38** Rabbiyow, cadhadaada ha igu canaanan, Oo dhirifkaaga kululna ha igu edbin. 2 Waayo, fallaadhahaagii aad bay ii mudeen, Oo gacantaaduna way igu soo degtay. 3 Jidhkaygu fayoobaan ma leh, waana xanaaqaaga daraaddiis, Oo lafahayguna caafimaad ma leh, waana dembigayga daraaddiis. 4 Waayo, xumaatooyinkaygii waxay ka sare mareen madaxayga, Sida rar culus ayay igu culus yihiin aad iyo aad. 5 Nabrahaygu way urayaan, wayna qudhmuun yihiin, Waana nacasnimadayda daraaddeed. 6 Waan xanuunsanayaa, oo aad baan hoos ugu gotay, Oo maalinta oo dhanna oohin baan la wareegaa. 7 Waayo, dhexdayda waxaa ka buuxa olol, Oo jidhkayguna fayoobaan ma leh. 8 Waan itaal daranahay, oo aad baan u burbursanahay, Oo waxaan la cabaaday buuqa qalbigayga ku jira. 9 Sayidow, waxaan jeclahay oo dhammu waxay yaalliin hortaada, Oo taahiddayduna kaama qarsoona. 10 Wadnahaa i fig leh, oo xooggaygiina waa i gabay, Oo weliba iftiinkii indhahayguna waa iga tegey. 11 Kuwa i jecel iyo saaxiibbadayba belaayadayda way ka durkaan, Oo xigaaladaydiina meel fog bay istaagaan. 12 Oo kuwa naftayda doondoonaana dabinno bay ii dhigaan, Oo kuwa inay wax i yeelaan doonayaana waxay ku hadlaan waxyaalo xun, Oo maalinta oo dhan waxay ku tashadaan khiyaano. 13 Laakiinse anigu waxba kama maqlo sida nin dhega la', Oo waxaan la mid ahay nin carrab la' oo aan afkiisa kala qaadin. 14 Haah, oo waxaan la mid ahay nin aan waxba maqlin, Oo aan afkiisa murammo ku jirin. 15 Waayo, Rabbiyow, adaan wax kaa rajaynayaa, Oo adna waad ii jawaabi doontaa, Sayidow Ilaahaygiiyow. 16 Waayo, waxaan idhi, Yaanay igu rayrayn, Oo markii cagtaydu simbiriirixato, yaanay iska kay weynayn. 17 Waayo, waxaan ku dhowahay inaan dhaco, Oo tiiraanyadayduna had iyo goorba way i hor taalaa. 18 Haddaba anigu xumaantayda waan sheegi doonaa, Oo dembigaygana waan ka qoomamoon doonaa. 19 Laakiinse cadaawayaashaydu waa dadaal badan yihiin, xoogna way leeyihiin, Oo kuwa gardarrada igu necebuna way tarmeen. 20 Oo weliba kuwa sharka wanaagga ku gudaana Waa cadaawayaashayda, maxaa yeelay, waxaan raacaa waxa wanaagsan. 21 Rabbiyow, ha i dayrin, Ilaahayow, ha iga fogaan. 22 Soo dhaqso oo i caawi, Sayidow, badbaadadaydow.

**39** Waxaan idhi, Jidadkaygaan iska jiri doonaa, Si aanan carrabkayga ugu dembaabin, Oo afkayga waxaan ku qaban doonaa xakame inta kii shar lahu i hor joogo. 2 Waan carrab beelay oo shib baan iska idhi, oo waan ka aamusay xataa wixii wanaagsanaa, Tiiraanyadaydiina waa kacday. 3 Qalbigaygu uurkayguu ku kululaaday, Oo intii aan fikirayay ayaa dabkii shidmay, Markaasaan carrabkaygii ku hadlay, oo idhi, 4 Rabbiyow, i ogaysii ugu dambaystayda Iyo cimrigayga dhererkiisu intuu yahay, Oo i ogaysii inta tabardarradaydu tahay. 5 Bal eeg, maalmahayga waxaad ka dhigtay calaacal ballaadhkeed Oo cimrigayguna hortaada waxba kuma aha, Hubaal nin kastaba marka xaalkiisu ugu wanaagsan yahay dhammaantiis waa bilaash. (Selaah) 6 Hubaal nin kastaaba wuxuu ku socdaa hawo been ah, Hubaal waxay ku rabshaysan yihiin hawo been ah, Isagu maal buu tuulaa, mana uu yaqaan kii urursan doona. 7 Haddaba Sayidow, bal

maxaan sugaa? Waayo, rajadaydu adigay kugu xidhan tahay.
8 Xadgudubyadayda oo dhan iga samatabbixi, Oo ha iga
dhigin mid nacasyadu caayaan. 9 Anigu waan carrab la'aa,
oo afkaygana ma aan kala qaadin, Maxaa yeelay, sidaasaad
yeeshay. 10 Haddaba belaayadaada iga durki, Maxaa yeelay,
waxaa i baabbi'iyey weerarka gacantaada. 11 Markaad
dadka canaanta ku edbisid xumaanta daraaddeed, Waxaad
quruxdiisa ka dhigtaa inay u baabba'do sidii balanbaallis
oo kale, Hubaal nin kastaaba waa bilaash. (Selaah) 12
Rabbiyow, baryadayda maqal, oo qayladaydana dhegta u
dhig, Oo ilmadaydana ha iskaga aamusin, Waayo, waxaan
ahay qariib kula jooga Oo masaafir ah, sidii awowayaashay
oo dhammu ay ahaan jireen. 13 Ii tudh, itaalkaygu mar ha igu
soo noqdee, Intaanan meesha tegin oo aanan mar dambe
ka soo noqonayn.

**40** Anigu Rabbiga samir baan ku sugay, Oo isna wuu i
soo jalleecay, qayladaydiina wuu maqlay, 2 Oo weliba
wuxuu iga soo bixiyey yamays baabba' ah, iyo dhoobada
dhiriqda ah, Oo wuxuu cagaha ii saaray dhagax weyn, oo
socodkaygiina wuu xoogeeyey. 3 Oo afkaygiina wuxuu
geliyey gabay cusub, kaas oo ah ammaanta Ilaaheenna.
Kuwo badan baa arki doona, wayna cabsan doonaan,
Rabbigayna isku hallayn doonaan. 4 Waxaa barakaysan
ninkii Rabbiga isku halleeya, Oo aan u jeedin kuwa kibirsan
ama kuwa beenta ku leexda. 5 Rabbiyow, Ilaahayow,
shuqullada yaabka badan oo aad samaysay way badan
yihiin, Oo fikirradaada aad naga qabtidna way badan yihiin,
Oo iyaga lama xisaabi karo, Haddii aan sheego oo ka hadlo,
Iyagu way ka sii badan yihiin wax la tirin karo. 6 Allabari
iyo qurbaan kuma aad faraxsanid, Oo anna dhegahaygii
waad ii furtay, Qurbaan la gubo iyo qurbaanka dembiga
midna ima aad weyddiisan. 7 Oo markaasaan idhi, Bal
eeg, anigu waan imid, Oo kitaabka duudduuban wax igu
saabsan baa ku qoran. 8 Ilaahayow, waxaan jeclahay inaan
sameeyo doonistaada, Haah, oo sharcigaagu wuxuu ku
dhex jiraa qalbigayga. 9 Xaqnimo baan shirka weyn ku dhex
wacdiyey, Oo bal eeg, inaanan bushimahayga ka joojin,
Waad og tahay, Rabbiyow. 10 Xaqnimadaada qalbigayga
kuma aan qarin, Aaminnimadaada iyo badbaadintaadana
waan sheegay, Oo raxmaddaada iyo runtaadana kama
aan qarin shirka weyn. 11 Rabbiyow, naxariistaada ha iga
ceshan, Raxmaddaada iyo runtaaduna had iyo goorba
ha i dhawreen. 12 Waayo, xumaatooyin aan la tirin karin
ayaa i hareereeyey, Oo dembiyadaydii ayaa i qabsaday,
sidaas daraaddeed kor ma fiirin karo, Iyagu way ka badan
yihiin timaha madaxayga, oo qalbigaygiina waa i gabay. 13
Rabbiyow, waan ku baryayaaye, i samatabbixi, Rabbiyow, u
soo dhaqso inaad i caawiso. 14 Kuwa doonaya inay naftayda
halligaan ha ceeboobeen, Oo dhammaantood ha wareereen,
Oo kuwa waxyeelladayda ku farxana Dib ha loo celiyo, oo
sharafdarro ha ku soo degto. 15 Kuwa aniga, Ahaa, Ahaa, igu
yidhaahda, Ceebtooda daraaddeed ha la fajeceen. 16 Kuwa
adiga ku doondoona oo dhammu ha reyreeyeen oo ha kugu
farxeen, Oo kuwa badbaadintaada jecelu had iyo goorba
ha yidhaahdeen, Rabbiga ha la weyneeyo! 17 Laakiinse
anigu waxaan ahay miskiin iyo mid baahan, Sayidkuse waa i
xusuustaa. Ilaahayow, waxaad tahay caawimaaddayda iyo
samatabbixiyahayga, Haddaba ha iga raagin.

**41** Waxaa barakaysan kii ka fikira miskiinka, Maalinta
shar jiro Rabbigu waa samatabbixin doonaa isaga. 2
Rabbigu wuu dhawri doonaa, wuuna sii noolayn doonaa, oo
isaguna dhulkuu ku barakaysnaan doonaa. Rabbow, isaga
ha u gacangelin sida cadaawayaashiisu rabaan. 3 Rabbigu
wuxuu isaga ku gargaari doonaa sariirta taagdarradiisa. Oo
markuu bukana sariirtiisa oo dhan waad u hagaajisaa. 4
Anigu waxaan idhi, Rabbiyow, ii naxariiso, Oo naftayda bogsii,
waayo, waan kugu dembaabay. 5 Cadaawayaashaydu shar
bay iga sheegaan, oo waxay yidhaahdaan, War goormuu
dhiman doonaa, oo magiciisu baabbi'i doonaa? 6 Oo
midkood hadduu i soo booqdona been buu ku hadlaa, Oo
qalbigiisuna xumaatuu urursadaa; oo markuu dibadda u
baxo ayuu ka warramaa. 7 Kuwa i neceb oo dhammu anigay
ii wada faqaan, Oo waxay iigu wada tashadaan si ay wax
ii yeelaan. 8 Waxay yidhaahdaan, Cudur xun baa isagii
ku dhacay, Oo haatan wuu jiifaa, mar dambena sooma uu
kici doono. 9 Xataa saaxiibkaygii aan isku halleeyey, oo
kibistaydii cunay, Ayaa cedhibtiisa ii qaaday. 10 Laakiinse,
Rabbiyow, ii naxariiso, oo mar i sara jooji, Aan iyaga
ka aar goostee. 11 Tan ayaan ku garanayaa inaad igu
faraxsan tahay, Maxaa yeelay, cadowgaygu igama guulaysto.
12 Laakiinse aniga waxaad ii tiirisaa daacadnimadayda
aawadeed, Oo weligaaba waxaad i fadhiisisaa wejigaaga
hortiisa. 13 Weligiis iyo weligiisba Waxaa mahad leh Rabbiga
ah Ilaaha Israa'iil. Aamiin iyo Aamiin.

**42** Sida deeradu biyaha durdurka ugu harraaddo, Ayay
naftaydu kuugu harraaddaa, Ilaahayow. 2 Naftaydu
waxay u oomman tahay Ilaah, kaasoo ah Ilaaha nool.
Goormaan u tegi doonaa oo aan Ilaah hortiisa ka muuqan
doonaa? 3 Habeen iyo maalinba waxaa cunto ii noqday
ilmadaydii, Intay had iyo goorba i leeyihiin, Ilaahaagu
meeh? 4 Haddaba waan qarracmaa markaan soo xusuusto
waxyaalahan, Sidaan guutada u raaci jiray, oo aan iyaga ugu

hor kici jiray guriga Ilaah, Annagoo ku heesayna cod farxad
ah iyo ammaan, oo ah dad fara badan oo iidaya. 5 Naftaydoy,
bal maxaad u murugaysan tahay? Oo bal maxaad gudahayga
ugu rabshaysan tahay? Ilaah ku kalsoonow, waayo, weli
waxaan isaga u ammaanayaa caawimaadda wejigiisa. 6
Ilaahayow, naftaydu waa igu murugaysan tahay, Oo sidaas
daraaddeed waxaan ka xusuusnahay dalkii Urdun, Iyo
fiiqfiiqyada Buur Xermoon iyo Buur Miscaar. 7 Moolba mool
buu u yeedhaa markay biya dhacu qaylinayaan, Hirarkaagii
iyo mawjadahaagii oo dhammu dushayday mareen. 8
Laakiinse Rabbigu maalinnimada wuxuu soo diri doonaa
raxmaddiisa, Oo habeennimadana waxaa ila jiri doona
gabaygiisa, Iyo baryootanka aan Ilaaha noloshayda baryo.
9 Waxaan Ilaaha dhagaxayga weyn ah ku odhan doonaa,
Bal maxaad ii illowday? Dulmiga cadowga daraaddiis bal
maxaan ula sii cabaadaa? 10 Sida iyadoo seefu lafahayga
burburinayso, ayaa cadaawayaashaydu i caayaan, Intay had
iyo goorba i leeyihiin, Ilaahaagu meeh? 11 Naftaydoy, bal
maxaad u murugaysan tahay? Oo bal maxaad gudahayga
ugu rabshaysan tahay? Ilaah ku kalsoonow, waayo, weli
waxaan ammaanayaa Isagoo ah caawimaadda wejigayga
iyo Ilaahay.

**43** Ilaahow, ii gar soor, oo dacwadayda kala muddac
quruun aan cibaado lahayn, Iga samatabbixi ninka
khiyaanada badan oo xaqa daran. 2 Waayo, waxaad tahay
Ilaaha xoogga ii ah, bal maxaad ii xoortay? Dulmiga cadowga
daraaddiis bal maxaan ula sii cabaadaa? 3 Nuurkaaga
iyo runtaada ii soo dir, oo ha i hoggaamiyeen, Oo ha i
keeneen buurtaada quduuska ah, iyo taambuugyadaada.
4 Oo markaasaan tegi doonaa meesha allabariga Ilaah,
Iyo Ilaaha ah farxaddayda weyn, Ilaahow, Ilaahaygiiyow,
kataaradda waan kugu ammaani doonaa. 5 Naftaydoy, bal
maxaad u murugaysan tahay? Oo bal maxaad gudahayga
ugu rabshaysan tahay? Ilaah ku kalsoonow, waayo, weli
waxaan ammaanayaa Isagoo ah caawimaadda wejigayga
iyo Ilaahay.

**44** Ilaahow, dhegahayagaannu ku maqallay, oo waxaa
noo sheegay awowayaashayo Shuqulkii aad samaysay
wakhtigoodii oo ahaa waa hore. 2 Quruumihii gacantaadaad
ku eriday, oo meeshoodii awowayaashayo baad ku beertay,
Dadyowgii waad dhibtay, oo dibaddaad ku kala firdhisay.
3 Waayo, iyagu dalka kuma hantiyin seeftooda, Oo
cududdooduna ma ay badbaadin, Laakiinse midigtaada iyo
cududdaada iyo nuurka wejigaaga ayaa badbaadshay iyaga,
Maxaa yeelay, raalli baad ka ahayd. 4 Ilaahow, waxaad
tahay boqorkayga, Haddaba reer Yacquub samatabbixin u
amar. 5 Adiga daraaddaa ayaannu cadaawayaashayada
hoos ugu riixaynaa, Oo magacaaga daraaddiis ayaan kula
tumanaynaa kuwa nagu kaca. 6 Waayo, qaansadayda isku
hallayn maayo, Oo seeftayduna i badbaadin mayso. 7
Laakiinse adigu cadaawayaashayadaad naga badbaadisay,
Oo kuwa na necebna waad ceebaysay. 8 Maalinta oo
dhan waxaannu ku faannaa Ilaah, Oo annana weligayo
waxaannu ku mahadnaqaynaa magacaaga. (Selaah) 9
Laakiinse haatan waad na xoortay, oo sharafdarrona waad
nagu soo dejisay, Oo weliba ciidammadayadana ma aad
hor kacdid. 10 Waxaa dib nooga celisaa cadowgayaga
hortiisa, Oo kuwa na necebuna way na dhacaan. 11 Waxaad
naga dhigtay sidii ido la qalayo, Oo waxaad nagu kala
firdhisay quruumaha dhexdooda. 12 Dadkaaga qiimola'aan
baad ku iibisaa, Oo maalkaagana kuma aad kordhin
qiimahoodii. 13 Deriskayaga waxaad nooga dhigtaa cay,
Oo kuwa hareerahayaga ku wareegsanna waxaad nooga
dhigtaa quudhsasho iyo qosol. 14 Quruumaha dhexdooda
waxaad nooga dhigtaa halqabsi, Dadyowga dhexdoodana
waxaad nooga dhigtaa kuwa madaxa laga lulo. 15 Maalinta
oo dhan sharafdarradaydu way i hor taal, Oo waxaa iga
muuqatay ceebtii wejigayga, 16 Waayo, sababtu waxaa
weeye codka kan i caaya oo i af xumeeya, Iyo cadowga
iyo kan iga aarguta daraaddood. 17 Waxyaalahaas oo
dhammu way nagu dhaceen, laakiinse weli kuma aannu
illoobin, Axdigaagana khiyaano kuma aannu samayn. 18
Qalbigayagu dib uma noqon, Oo tallaabooyinkayaguna
jidkaaga kama baydhin, 19 Adiguse waxaad si xun noogu
jebisay meeshii dawacooyinka, Oo waxaad nagu qarisay
hooskii dhimashada. 20 Haddii aannu illownay magicii
Ilaahayaga, Ama aannu gacmahayaga u kala bixinnay ilaah
qalaad, 21 Ilaah miyaanu waxaas baadhayn? Waayo, isagu
waa wada og yahay qalbiga waxyaalihiisa qarsoon. 22
Haah, oo adiga daraaddaa ayaa naloo laayaa maalinta
oo dhan, Oo waxaannu noqonnaa sida ido la qalayo. 23
Toos, maxaad u huruddaa, Sayidow? Sara joogso, oo ha na
xoorin weligaa. 24 Bal maxaad wejiga nooga qarsanaysaa,
Oo aad u illoobaysaa dhibaatada iyo dulmiga aan ku dhex
jirno? 25 Waayo, naftayadu ciidday ku foororsatay, Oo
calooshayaduna dhulkay ku dhegtaa. 26 Caawimaaddayada
daraaddeed u sara joogso, Oo raxmaddaada daraaddeed
noo furo.

**45** Qalbigaygu wuxuu la buuxdhaafaa hadal wanaagsan,
Oo waxaan boqorka u sheegayaa waxyaalihii aan
sameeyey, Carrabkaygu waa sida karraani dhaqsiyo badan
qalinkiis. 2 Adigu waad ka sii quruxsan tahay binu-
aadmiga, Oo bushimahaaga waxaa ka buuxda nimco,

Sidaas daraaddeed ayaa Ilaah kuu barakeeyey weligaaba.
3 Seeftaadu bowdadaada ha saarnaato, kaaga xoogga
badanow, Oo quruxda iyo haybadda lahow. 4 Runta
iyo camalqabowga iyo xaqnimada daraaddood, Waxaad
faraskaaga ku fuushaa haybad adigoo barwaaqaysan,
Oo gacantaada midigna waxay ku bari doontaa waxyaalo
cabsi badan. 5 Fallaadhahaagu waa af badan yihiin, Oo
waxay wadnaha ka mudaan boqorka cadaawayaashiisa,
Dadyowguna hoostaaday ku soo dhacaan. 6 Carshigaagu,
Ilaahow, waa weligiis iyo weligiis, Oo ul caddaaladdeedna
waa usha boqortooyadaada. 7 Adigu xaqnimada waad
jeclayd, oo xumaantana waad necbayd, Sidaas daraaddeed
Ilaaha Ilaahaaga ahi wuxuu kuugu subkay Saliidda farxadda,
oo kuwa ku weheliyana wuu kaa sarraysiiyey. 8 Dharkaaga
oo dhan waxaa ka soo carfa malmal, iyo cuud, iyo qasica.
Oo qasriyo fool maroodi ah ayaa kaaga farxiyey alaab
muusiko xadhko leh. 9 Dumarkaaga sharafta leh waxaa
ku jira gabdhaha boqorrada, Midigtaadana waxaa taagan
boqoradda oo isku sharraxday dahabkii Oofir. 10 Haddaba,
gabadhoy, bal i maqal, oo fiirso, oo dhegta soo dhig, Oo
weliba waxaad illowdaa dadkaagii iyo gurigii aabbahaa; 11
Markaasuu boqorku quruxdaada jeclaanayaa, Waayo, isagu
waa sayidkaaga, oo adna isaga u sujuud. 12 Oo waxaa
halkaas joogi doonta gabadha reer Turos, iyadoo hadiyad
wadda, Xataa taajiriinta dadka ku jirtaa waxay kaa baryi
doonaan raallinimo. 13 Gabadha boqorka oo hoyga boqorka
joogtaa waa qurux miidhan, Dharkeeda dahab baa lagu dhex
sameeyey. 14 Waxaa boqorka loo geeyn doonaa iyadoo
sharraxan, Bikradaha saaxiibadaheeda ah oo iyada daba
socdana waa laguu keeni doonaa. 15 Waxaa iyaga lagu
hoggaamin doonaa farxad iyo rayrayn, Oo waxay soo geli
doonaan hoyga boqorka. 16 Meeshii awowayaashaa waxaa
joogi doona wiilashaada, Kuwaas oo aad dunida oo dhan
amiirro uga dhigi doonto. 17 Magacaaga waxaan ka dhigi
doonaa mid ka ab ka ab la xusuusto, Sidaas daraaddeed
dadyowgu mahad bay kuu naqi doonaan weligood iyo
weligood.

46 Ilaah waa magangalkeenna iyo xooggeenna, Oo
waa caawimaad inoo diyaar ah wakhtiga dhibaatada.
2 Sidaas daraaddeed cabsan mayno in kastoo dhulku
beddelmo, Iyo in kastoo buurahu badda uurkeeda ku
dhex dhaqaaqaan, 3 Iyo in kastoo biyaheedu guuxaan oo
qasmaan, Iyo in kastoo ay buurahu kibirkooda la ruxruxmaan.
(Selaah) 4 Waxaa jira webi durdurradiisu ay ka farxiyaan
magaalada Ilaah, Taasoo ah meesha quduuska ah ee
Ilaaha ugu sarreeya taambuugyadiisa. 5 Ilaah baa iyada ku
dhex jira, mana ay dhaqaaqi doonto, Oo Ilaah baa iyada
ku caawin doona marka waagu beryo. 6 Quruumihii way
cabaadeen, oo boqortooyooyinkiina way dhaqdhaqaaqeen,
Codkiisii buu ku hadlay, oo dhulkii baa dhalaalay. 7
Rabbiga ciidammadu waa inala jiraa, Oo Ilaaha Yacquub
baa magangalkeenna ah. (Selaah) 8 Bal kaalaya arka
shuqullada Rabbiga, Iyo halaagga uu ku sameeyey dhulka.
9 Dagaallada wuu ku joojiyaa tan iyo dunida meesha ugu
dambaysa, Qaansada wuu jebiyaa, oo warankana wuu jaraa,
Oo gaadhifardoodkana dab buu ku gubaa. 10 Iska daaya oo
ogaada inaan anigu Ilaah ahay, Waa laygu sarraysiin doonaa
quruumaha dhexdooda, dhulkana waa laygu sarraysiin
doonaa. 11 Rabbiga ciidammadu waa inala jiraa, Oo Ilaaha
Yacquub baa magangalkeenna ah. (Selaah)

47 Dadyowga oo dhammow, kulligiin sacabka tuma, Oo
Ilaah cod guuleed ugu qayliya. 2 Waayo, Rabbiga ah
Ilaaha ugu sarreeya waa cabsi miidhan, Oo isagu waa boqor
weyn oo dhulka oo dhan u taliya. 3 Isagu dadyowga wuxuu
gelin doonaa hoosteenna, Quruumahana wuxuu ka hoos
marin doonaa cagaheenna. 4 Isagu dhaxalkeenna ayuu
inoo dooran doonaa, Kaasoo ah ammaanta Yacquub uu
jecel yahay. (Selaah) 5 Ilaah qaylo buu la kacay, Oo wuxuu
Rabbiguna la kacay dhawaaqa buunka. 6 Ilaah ammaan
ugu heesa, ammaan ugu heesa, Ammaan ugu heesa
Boqorkeenna, ammaan heesa. 7 Waayo, Ilaah waa dunida oo
dhan Boqorkeeda, Haddaba sabuur ammaan ah ku heesa.
8 Ilaah wuxuu u taliyaa quruumaha, Ilaahna carshigiisa
quduuska ah ayuu ku fadhiistaa. 9 Dadyowga amiirradoodii
oo dhammu waxay isu soo wada urursadeen Inay dadka
Ilaaha Ibraahim noqdaan, Waayo, dhulka gaashaammadiisa
waxaa iska leh Ilaah. Oo isaga aad iyo aad baa loo
sarraysiiyey.

48 Rabbigu waa weyn yahay, waana in aad loogu
ammaanaa Ilaaheenna magaaladiisa, iyo buurtiisa
quduuska ah. 2 Waxaa dhererka ku quruxsan, oo farxad
u ah dunida oo dhan Buur Siyoon oo dhanka woqooyi
ah, Meeshaas oo ah magaalada Boqorka weyn. 3 Ilaah
wuxuu daaraheeda dhaadheer isku muujiyey inuu magangal
yahay. 4 Waayo, bal eeg, boqorradii way iswada urursadeen,
Dhammaantood way wada dhaafeen. 5 Oo kolkay arkeen
ayay yaabeen, Oo argaggexeen, markaasay haddiiba
carareen. 6 Iyagii halkaasay ku gariireen, Wayna ku
xanuunsadeen sida naag foolanaysa. 7 Doonniyaha Tarshiish
waxaad ku jejebisaa Dabaysha bari. 8 Annagu sidaan
maqalnay, ayaan ku dhex aragnay Magaalada Rabbiga
ciidammada, taasoo ah magaalada Ilaaheenna, Ilaah ayaa
weligeedba adkayn doona. (Selaah) 9 Ilaahow, raxmaddaada

ayaan ka fikirnay Markaan macbudkaaga ku jirnay. 10
Ilaahow, sida magacaagu yahay Ayaa ammaantaaduna ku
tahay dhulka darafyadiisa oo dhan, Gacantaada midigna
waxaa ka buuxda xaqnimo. 11 Buur Siyoon ha faraxdo, Oo
gabdhaha reer Yahuudah ha ku reyreeyeen xukummadaada
daraaddood. 12 Siyoon hareeraheeda socda, oo ku soo
wareega, Oo munaaradaheeda tiriya. 13 Bal aad ugu fiirsada
qalcadaheeda, Oo ka fikira daaraheeda dhaadheer, Si aad
ugu sheekaysaan farcanka soo socda. 14 Waayo, weligiis iyo
weligiisba Ilaahan ayaa Ilaah inoo ah, Oo isagaa hoggaamiye
inoo ahaan doona xataa tan iyo dhimashada.

**49** Dadyowga oo dhammow, bal tan maqla, Dunida
kuwiinna degganow, kulligiin dhegta u dhiga, 2 Kuwiinna
hoose iyo kuwiinna sare, Taajirrada iyo masaakiintoy,
dhammaantiin wada maqla. 3 Afkaygu wuxuu ku hadli
doonaa xigmad, Qalbigayguna wuxuu ka fikiri doonaa
waxgarasho. 4 Dhegtayda waxaan u dhigi doonaa masaal,
Xujadaydana waxaan ku muujin doonaa kataaradda. 5
Haddaba bal maxaan u cabsanayaa wakhtiga shar jiro,
Markii xumaanu cedhbahayga ku wareegsanto? 6 Kuwa
maalkooda isku halleeya, Oo ku faana hodantinimadooda
faraha badan, 7 Midkoodna walaalkiis ma furan karo,
Daraaddiisna Ilaah madaxfurasho uma siin karo, 8 (Waayo,
furashada naftoodu waa qaali aad iyo aad, Kumana filna
weligeedba, ) 9 Inuu isagu weligiis sii noolaado, Oo aanu
halligaad arkin weligiis. 10 Waayo, isagu wuxuu arkaa inay
dadka xigmadda lahu wada dhintaan, Iyo in nacasyada iyo
doqonnaduba ay wada baabba'aan, Oo ay maalkooda kuwa
kale uga tagaan. 11 Waxay ismoodsiiyaan inay guryahoodu
weligoodba sii jirayaan, Iyo in meelaha rugtooda ahu ay sii
raagayaan tan iyo qarniyada oo dhan, Oo dhulalkoodana
way isku magacaabaan. 12 Laakiinse binu-aadmigu sharaf
kuma waaro, Wuxuu la mid yahay sida xayawaanka iska
baabba'a. 13 Jidkoodanu waa kalsoonidooda nacasnimada
ah, Laakiinse dadka iyaga ka dambeeya ayaa hadalkoodii
u boga. (Selaah) 14 Iyagu waxaa weeye adhi She'ool loo
wado, Oo waxaa sida adhijir u ahaan doona dhimasho,
Oo kuwa qumman ayaa iyaga subaxda u talin doona, Oo
quruxdoodana waxaa baabbi'in doona She'ool, inaanay
iyagu rug yeelan innaba. **(Sheol h7585)** 15 Laakiinse Ilaah
naftayda wuu ka soo furan doonaa xoogga She'ool, Waayo,
wuu i aqbali doonaa. (Selaah) **(Sheol h7585)** 16 Ha baqin markii
mid taajiroobo, Oo ammaanta reerkiisu aad u korodho, 17
Waayo, isagu markuu dhinto waxba sii qaadan maayo, Oo
ammaantiisuna ka daba geli mayso. 18 In kastoo uu naftiisa
u duceeyey markuu noolaa, Oo dad adiga ku ammaana,
kolkaad wax wanaagsan isu samaysid, 19 Isagu wuxuu u
tegi doonaa qarniyadii awowayaashiis, Oo iyana weligood
iftiinka ma ay arki doonaan. 20 Ninkii sharaf leh oo aan
garaad lahaynu Wuxuu la mid yahay sida xayawaanka iska
baabba'a.

**50** Ilaah, oo ah Ilaaha Rabbiga ah ayaa hadlay, Oo qorrax-
soo-baxa ilaa qorraxdhaca dhulkuu u yeedhay. 2
Siyoon oo ah meesha quruxda kaamilka ah Ayaa Ilaah
ka soo iftiimay. 3 Ilaaheen wuu iman doonaa, iskamana
aamusi doono, Hortiisa ayaa dab wax baabbi'in doonaa,
Hareerihiisana waxaa jiri doona duufaan weyn. 4 Isagu
wuxuu u yeedhi doonaa samooyinka sare, Iyo dhulkaba, inuu
dadkiisa xukumo aawadeed. 5 Oo wuxuu odhan doonaa,
Quduusiintayda ii soo wada ururiya, Kuwii axdi igula dhigtay
allabari. 6 Oo samooyinka ayaa xaqnimadiisa sheegi doona,
Waayo, Ilaah qudhiisu waa xaakin. (Selaah) 7 Dadkaygiiyow,
i maqla, oo anna waan hadli doonaa, Israa'iilow, i maqal
oo anna waan kuu markhaati furi doonaa, Anigu waxaan
ahay Ilaah, oo ah Ilaahaaga. 8 Anigu kugu canaanan
maayo allabaryadaada, Oo qurbaannadaada gubanu had
iyo goorba hortayday yaalliin. 9 Reerkaaga dibi ka qaadan
maayo, Xerooyinkaagana orgi kala bixi maayo. 10 Waayo,
xayawaanka duudda jooga oo dhan anigaa iska leh, Iyo
xataa xoolaha kunka buurood jooga oo dhan. 11 Waan
wada aqaan haadda buuraha joogta oo dhan, Oo dugaagga
duurka jooga oo dhanna anigaa iska leh. 12 Haddaan
gaajaysnahay, kuuma aan sheegeen, Waayo, dunida iyo
waxa ka buuxaba anigaa iska leh. 13 Miyaan cuni doonaa
hilibka dibida, Miyaanse cabbi doonaa dhiigga riyaha?
14 Ilaah u bixi allabariga mahadnaqiddaa, Oo Ilaaha ugu
sarreeyana nidarradaadii u oofi, 15 Oo i bari maalinta dhibi
jirto, Oo anna waan ku samatabbixin doonaa, kolkaasaad i
ammaani doontaa. 16 Laakiinse Ilaah wuxuu kan sharka leh
ku yidhaahdaa, Maxaad qaynuunnadayda u sheegaysaa,
Oo aad axdigayga afkaaga ugu soo qaadaysaa? 17 Adigoo
tacliinta neceb, Oo weliba erayadaydana dabadaada ku
tuura. 18 Markaad tuug aragtay waad oggolaatay, Oo waxaad
la qayb qaadatay dhillayo. 19 Afkaaga waxaad u daysaa inuu
shar ku hadlo, Oo carrabkaaguna wuxuu hindisaa khiyaano.
20 Waad fadhiisataa oo wax ka sheegtaa walaalkaa, Oo
weliba waxaad xamataa inahooyadaa. 21 Waxyaalahaas
baad samaysay, oo anna waan iska aamusay, Waxaad
moodday inaan ahay mid kula mid ah, Laakiinse waan ku
canaanan doonaa, oo iyaga ayaan indhahaaga hortooda ku
hagaajin doonaa. 22 Kuwiinna Ilaah illoobayow, bal waxan
ka fiirsada, Waaba intaasoo aan cadcad idiin jeexjeexaaye,

oo aad wax idin samatabbixiya weydaane, 23 Ku alla kii
allabariga mahadnaqidda bixiyaa waa i ammaanaa, Oo kii
socodkiisa si qumman u hagaajiyana Waxaan tusi doonaa
badbaadinta Ilaah.

**51** Ilaahow, iigu naxariiso sida raxmaddaadu tahay, Oo
xadgudubyadaydana igaga tirtir sida naxariistaada
badnaanteedu tahay. 2 Xumaantayda iga wada maydh,
Oo iga nadiifi dembigayga. 3 Waayo, anigu waan ogahay
xadgudubyadayda, Oo dembigayguna hortayduu yaallaa
had iyo goorba. 4 Adiga keliya ayaan kugu dembaabay,
Oo waxaan sameeyey wax hortaada ku xun, Inaad xaq
ahaatid markaad hadashid, Oo aad daahir ahaatid markaad
wax xukunto. 5 Bal eeg, aniga waxaa laygu qabanqaabiyey
xumaan, Oo waxaa hooyaday igu uuraysatay dembi. 6
Bal eeg, waxaad uurka ka jeceshahay run, Oo meesha
qarsoon waxaad iga ogeysiinaysaa xigmad. 7 Haddaba geed
husob ah igu daahiri, oo anna nadiif baan ahaan doonaa, I
maydh, oo anna baraf cad waan ka sii caddaan doonaa.
8 I maqashii farxad iyo rayrayn, Inay lafihii aad jejebisay
farxaan. 9 Wejigaaga ka qari dembiyadayda, Oo iga tirtir
xumaatooyinkayga oo dhan. 10 Ilaahow, igu dhex abuur
qalbi nadiif ah, Oo igu dhex cusboonaysii ruux qumman. 11
Hortaada ha iga xoorin, Oo Ruuxaaga quduuska ah ha iga
qaadin. 12 Farxaddii badbaadintaada ii soo celi, Oo ruux
raalli ah igu tiiri. 13 Oo markaas kuwa xadgudba jidkaagaan
bari doonaa, Oo dembilayaashuna adigay kuu soo noqon
doonaan. 14 Ilaahow, Ilaaha badbaadadaydow, dhiiggelidda
iga samatabbixi, Markaasaa carrabkaygu wuxuu aad uga
gabyi doonaa xaqnimadaada. 15 Sayidow, bushimahayga
fur, Oo afkaygu wuxuu ku hadli doonaa ammaantaada. 16
Waayo, adigu kuma faraxdid allabari, haddii kalese waan
bixin lahaa, Qurbaan gubanna kuma cajebiyo. 17 Allabaryada
Ilaah waa ruux is-hoosaysiintiisa, Ilaahow, adigu quudhsan
maysid qalbi hoosaysan oo qoomamaysan. 18 Siyoon
wanaag ugu samee sidaad doonayso, Oo Yeruusaalem
derbiyadeedana dhis. 19 Oo markaas adigu waxaad ku farxi
doontaa allabaryada xaqnimada iyo qurbaan guban, iyo
allabari wada guban dhammaantiis, Oo markaasay dibiyo ku
dul bixin doonaan meeshaada allabariga.

**52** Ninka xoogga badanow, bal maxaad xumaanta ugu
faanaysaa? Naxariista Ilaah had iyo goorba way
sii waartaa. 2 Carrabkaagu wuxuu hindisaa xumaato
weyn, Oo sida mandiil afaysan ayuu ka shaqeeyaa
khiyaano. 3 Wanaagga waxaad ka jeceshahay xumaanta,
Oo inaad xaqnimo ku hadashidna waxaad ka jeceshahay
beensheegidda. (Selaah) 4 Waxaad jeceshahay erayada
wax baabbi'iya oo dhan, Iyo carrab khiyaano miidhan ah. 5
Ilaahna sidaas oo kaluu kuu halligi doonaa weligaaba, Oo
isna kor buu kuu qaadi doonaa, oo wuxuu kaa bixin doonaa
teendhadaada, Oo wuxuu kaa saari doonaa kuwa nool
dalkooda. (Selaah) 6 Kuwa xaqa ahuna way arki doonaan,
oo way cabsan doonaan, Wayna ku qosli doonaan, oo waxay
odhan doonaan, 7 Waa kan ninkii aan Ilaah xooggiisa ka
dhiganu, Laakiinse wuxuu isku halleeyey hodantinimadiisa
badan, Oo wuxuu ku xoogaystay xumaatadiisii. 8 Laakiinse
anigu waxaan la mid ahay sida geed qoyan oo saytuun ah,
oo guriga Ilaah ku dhex yaal, Anigu weligay iyo weligayba
waxaan isku hallaynayaa naxariista Ilaah. 9 Weligayba waan
kugu mahadnaqayaa, maxaa yeelay, adigu waad samaysay,
Oo magacaaga ayaan wax ku rajaynayaa, waayo, wuu ku
wanaagsan yahay quduusiintaada hortooda.

**53** Nacaskaa qalbigiisa iska yidhi, Ilaah ma jiro. Iyagu waa
qudhun, oo waxay faleen xumaan karaahiyo ah, Oo
mid wanaag falaa ma jiro. 2 Ilaah wuxuu samada hoos uga
soo fiiriyey binu-aadmiga, Bal inuu arko hadday kuwo wax
garanaya oo Ilaah doondoonaa jiraan. 3 Midkood kastaaba
dib buu u noqday, oo dhammaantood waxay wada noqdeen
dad nijaas ah, Oo mid wanaag falaa ma jiro, midnaba. 4
Miyaanay aqoon lahayn xumaanfalayaasha dadkaygii u
cuna siday kibista u cunaan, Oo aanay Ilaah baryin? 5
Iyagu halkaasay aad ugu cabsadeen meel aan cabsiyu
jirin, Waayo, kii ku ag degay inuu kugu soo duulo Ilaah
baa lafihiisii kala firdhiyey, Oo iyagaad ceebaysay, maxaa
yeelay, Ilaah baa iyaga diiday. 6 Badbaadada reer binu
Israa'iil bal may Siyoon ka timaado! Marka Ilaah dadkiisa
maxaabiisnimada ka soo celiyo, Ayaa reer Yacquub rayrayn
doonaa oo reer binu Israa'iilna farxi doonaa.

**54** Ilaahow, magacaaga igu badbaadi, Oo xooggaaga iigu
garsoor. 2 Ilaahow, baryadayda maqal, Oo erayada
afkayga dhegta u dhig, 3 Waayo, shisheeyayaal baa igu
kacay, Oo rag dulmi badan ayaa doonayay inay nafta iga
qaadaan, Iyagu Ilaah kama fikirin. (Selaah) 4 Bal eega,
Ilaah waa gargaarahayga, Oo Sayidkuna wuxuu la jiraa
kuwa naftayda tiiriya. 5 Isagu sharka wuxuu ku celin doonaa
cadaawayaashayda, Iyaga runtaada ku baabbi'i. 6 Waxaan
kuu qali doonaa qurbaan ikhtiyaar ah, Rabbiyow, magacaaga
waan ku mahadnaqi doonaa, waayo wuu wanaagsan yahay.
7 Waayo, isagu wuxuu iga samatabbixiyey dhibaato oo dhan,
Oo ishayduna waxay cadaawayaashayda ku aragtay wixii
aan doonayay.

55 Ilaahow, tukashadayda dhegta u dhig, Oo
baryootankaygana ha iska qarin. 2 I maqal, oo ii
jawaab, Waxaan la nasan waayaa calaacalkayga, waanan
la taahaa, 3 Sababtuna waxaa weeye codka cadowga
daraaddiis, Iyo kan sharka leh cadaadintiisa daraaddeed,
Waayo, iyagu xumaan bay igu tuuraan, Maxaa yeelay, cadho
ayay igu silciyaan. 4 Wadnuhu aad buu ii xanuunayaa, Oo
waxaa igu dhacday cabsida dhimashada. 5 Baqdin iyo gariir
ayaa igu soo degay, Oo naxdin baa i dabooshay. 6 Oo
anna waxaan is-idhi, Waxaan jeclaan lahaa inaan baalal
yeesho sida qoolley oo kale! Markaasaan iska duuli lahaa oo
nasan lahaa. 7 Bal eeg, markaasaan iska warwareegi lahaa
meel fog, Oo waxaan degganaan lahaa cidlada. (Selaah) 8
Waxaan gabbaad kaga carari lahaa Dabaysha hufada ah iyo
duufaanka. 9 Sayidow, iyaga baabbi'i, oo afafkoodana kala
duw Waayo, waxaan magaalada ku arkay dulmi iyo dirir.
10 Maalin iyo habeenba derbiyadeeday ku dul wareegaan,
Oo weliba waxaa ku dhex jira xumaan iyo belaayo. 11
Dhexdeedana waxaa ku jira shar, Dulmi iyo khiyaanona
kama tagaan jidadkeeda. 12 Waayo, kii i caayay cadaawe
ma ahayn, Maxaa yeelay, waan u adkaysan kari lahaa, Mana
ahayn kii i necbaa oo iska kay weyneeyey, Maxaa yeelay,
waan ka dhuuman lahaa isaga, 13 Laakiinse wuxuu ahaa
adiga oo ah nin ila mid ah, Iyo jaalkay iyo saaxiibkay. 14 Si
wanaagsan baynu u wada sheekaysan jirnay, Oo waxaynu
ku dhex socon jirnay guriga Ilaah, innagoo guuto badan la
soconna. 15 Dhimasho ha ku soo kediso iyaga, Oo iyagoo
noolnool She'ool ha ku dhaceen, Waayo, xumaan baa ku
jirta hoygooda iyo dhexdooda. **(Sheol h7585)** 16 Laakiinse
anigu Ilaah baan baryi doonaa, Oo Rabbigaa i badbaadin
doona. 17 Fiidka, iyo subaxda, iyo duhurkaba, anigu waan
cataabi doonaa, oo waan taahi doonaa, Oo isna codkayguu
maqli doonaa. 18 Naftayda nabadduu kaga samatabbixiyey
dagaalkii iga geesta ahaa, Waayo, kuwii ila diriray way
badnaayeen. 19 Ilaah oo ah kan weligiis waara, Wuu
maqli doonaa oo u jawaabi doonaa iyaga, Kuwaas oo aan
beddelmin, (Selaah) Oo aan Ilaah ka cabsan. 20 Isagu wuxuu
u gacan qaaday kii isaga heshiiska la ahaa, Oo axdigiisiina
wuu buriyey. 21 Afkiisu wuxuu u nuglaa sidii subag oo kale,
Laakiinse qalbigiisu wuxuu ahaa dagaal, Erayadiisu saliid
way ka jilicsanaayeen, Laakiinse waxay ahaayeen seefo
galkii laga siibay. 22 Culaabtaada Rabbiga saar, oo isna
wuu ku xanaanayn doonaa, Waayo, isagu kan xaqa ah
marnaba u dayn maayo in la dhaqaajiyo. 23 Laakiinse,
Ilaahow, iyaga waxaad ku dhaadhicin doontaa yamayska
halligaadda, Dhiigyocabyada iyo dadka khaa'innada ahu
cimrigooda nus ma kadban doonaan, Laakiinse anigu waan
isku kaa hallayn doonaa.

56 Ilaahow, ii naxariiso, waayo dad baa waxay doonayaan
inay i liqaan; Maalinta oo dhan isagoo diriraya ayuu i
dulmaa. 2 Cadaawayaashaydu maalinta oo dhan waxay
doonayaan inay i liqaan, Waayo, kuwa kibirka igula diriraa
waa tiro badan yihiin. 3 Markaan cabsado, Waan isku kaa
hallaynayaa. 4 Ilaah caawimaaddiisa ayaan eraygiisa ku
ammaani doonaa, Waayo, Ilaah baan isku halleeyey, oo
innaba baqi maayo, Haddaba bal binu-aadmigu muxuu
igu samayn karaa? 5 Maalinta oo dhan erayadayda way
qalloociyaan, Fikirradooda oo dhammu waa igu col si ay
shar iigu sameeyaan. 6 Way isa soo wada urursadaan, oo
way dhuuntaan, Oo waxay fiirsadaan tallaabooyinkayga,
Markay gaadayaan naftayda. 7 Iyagu ma xumaan bay ku
baxsan doonaan? Ilaahow, dadyowga adoo cadhaysan hoos
u tuur. 8 Waad og tahay warwareeggayga, Bal ilmadayda
qaruuraddaada ku shub, Waayo, miyaanay buuggaaga ku
qorrayn? 9 Markaasaa cadaawayaashaydu dib u noqon
doonaan maalinta aan kuu yeedho, Waayo, waxaan ogahay
in Ilaah ila jiro. 10 Ilaah caawimaaddiisa ayaan eraygiisa ku
ammaani doonaa, Oo Rabbigana caawimaaddiisa ayaan
eraygiisa ku ammaani doonaa. 11 Ilaah baan isku halleeyey,
oo innaba baqi maayo, Haddaba bal dad muxuu igu samayn
karaa? 12 Ilaahow, nidarradaada waan qabaa, Oo waxaan
kuu bixinayaa qurbaanno mahadnaqid ah. 13 Waayo,
naftaydaad ka samatabbixisay dhimasho, Sow cagahayga
dhicitin kama aad samatabbixin? Inaan Ilaah hortiisa ku
socdo Iftiinka kuwa nool.

57 Ii naxariiso, Ilaahow, ii naxariiso, Waayo, naftaydu
adigay ku magan gashaa, Haah, waxaan magangeli
doonaa hooska baalashaada, Ilaa ay belaayooyinkanu
gudbayaan. 2 Waxaan u qayshanayaa Ilaaha ugu sarreeya,
Oo ah Ilaaha wax kasta ii sameeya. 3 Isagu samaduu
caawimaad ka soo diri doonaa, wuuna i badbaadin doonaa,
Markuu kan i liqi lahaa i caayo, (Selaah) Ilaah wuxuu soo
diri doonaa naxariistiisa iyo runtiisa. 4 Naftaydu waxay ku
dhex jirtaa libaaxyo, Oo anigu waxaan dhex jiifaa kuwo dab
lagu shiday, Kuwaasoo ah binu-aadmiga oo ilkahoodu yihiin
warmo iyo fallaadho, Oo carrabkooduna yahay seef af badan.
5 Ilaahow, samooyinka ka sara mar, Oo ammaantaaduna
dhulka oo dhan ha ka sarrayso. 6 Dabin bay cagahayga u
diyaariyeen, Oo naftaydii baa foororsatay, Oo waxay hortayda
ka qodeen god, Oo iyaga qudhoodii baa ku dhex dhacay.
(Selaah) 7 Qalbigaa ii fadhiya, Ilaahow, qalbigaa ii fadhiya,
Haddaba waan gabyi doonaa, haah, ammaan baan ku gabyi

doonaa. 8 Naftaydoy, toos, shareerad iyo kataaradoy, toosa,
Aniga qudhayduna waxaan toosi doonaa aroor hore. 9
Sayidow, dadyowga dhexdooda ayaan kaaga mahadnaqi
doonaa, Oo quruumaha dhexdooda ayaan ammaan kuugu
gabyi doonaa. 10 Waayo, naxariistaadu waa weyn tahay
oo waxay gaadhaa samooyinka, Oo runtaaduna waxay
gaadhaa daruuraha. 11 Ilaahow, samooyinka ka sara mar,
Oo ammaantaaduna dhulka oo dhan ha ka sarrayso.

**58** Hubaal xaqnimada aamusnaan ma ku sheegtaan?
Binu-aadmigow, si qumman wax ma u xukuntaan?
2 Hubaal qalbiga waxaad ka samaysaan xumaato, Oo
waxaad ka fikirtaan dulmiga gacmihiinna oo aad dhulka ku
samaysaan. 3 Kuwa sharka lahu waxay qalaad ku noqdaan
uurkii hooyadood, Oo mar alla markii ay dhashaan ayay
habaabaan iyagoo been sheegaya. 4 Suntoodu waa sida
abeesada waabaydeeda oo kale, Iyagu waa sida jilbis dhega
la' oo dhegihiisa fureeya, 5 Kaasoo aan maqlin codka
saaxiriinta, Iyagoo si caqli ah u sixraya. 6 Ilaahow, ilkahooda
afkooda ku dhex burburi, Rabbiyow, libaaxyada aaranka
ah miciyahooda jejebi. 7 Ha u dhalaaleen sida biyo aad
u durduraya. Markuu fallaadhihiisa wax ku liishaamo, ha
noqdeen sida wax kala jabay. 8 Ha noqdeen sida alalaxayda
dhalaasha oo iska baabba'da, Iyo sida dhicis naageed oo
aan qorraxda arkin. 9 Intaan dheryihiinnu qodxaha taaban,
Ayuu kuwa qoyan iyo kuwa ololayaba ku kala firdhin doonaa
dabayl cirwareen ah. 10 Kan xaqa ahu wuu rayrayn doonaa
markuu arko aargudashada, Oo wuxuu ku cago maydhan
doonaa kan sharka leh dhiiggiisa. 11 Sidaas daraaddeed
dadku wuxuu odhan doonaa, Hubaal kii xaq ahu abaalgud
buu leeyahay, Hubaal waxaa jira Ilaah dhulka xukuma.

**59** Ilaahayow, cadaawayaashayda iga samatabbixi, Oo
kuwa igu kacayna meel sare iga saar. 2 Iga samatabbixi
xumaanfalayaasha, Oo dadka dhiigyocabyada ahna iga
badbaadi. 3 Waayo, bal eeg, waxay gaadaan naftayda,
Oo kuwa xoogga badanuna way isu kay wada urursadaan,
Rabbiyow, weliba ma aha xadgudubkayga aawadiis iyo
dembigayga aawadiis toona. 4 Waxay u ordaan oo isu
diyaariyaan wax aanan eed ku lahayn, Dartay u kac
inaad i caawiso oo aad i eegto. 5 Rabbiyow, Ilaaha
ciidammadow, Ilaaha reer binu Israa'iilow, Sara joogso oo
quruumaha oo dhan soo booqo, Oo innaba ha u naxariisan
xadgudbayaasha. (Selaah) 6 Fiidkay soo noqdaan, oo waxay
u ciyaan sida eey oo kale, Oo waxay ku warwareegaan
magaalada hareeraheeda. 7 Afkooda waxaa ka qubmaysa
cay, Bushimahoodana waxaa ku jira seefo, Waayo, waxay
isyidhaahdaan, Bal yaa na maqla? 8 Laakiinse Rabbiyow,
iyagaad ku qosli doontaa, Quruumaha oo dhan waad
quudhsan doontaa. 9 Xooggaygiiyow, adigaan ku sugi
doonaa, Waayo, Ilaah waa qalcaddayda. 10 Ilaahayga
naxariista leh ayaa i hor iman doona, Oo waxaan doonayana
Ilaah wuxuu iga tusi doonaa cadaawayaashayda. 11 Sayidow,
gaashaankayagiiyow, Iyaga ha layn, waaba intaasoo ay
dadkaygu illoobaane, Laakiinse iyaga xooggaaga ku kala
firdhi, oo hoos u soo deji. 12 Kibirkoodu iyaga ha dabo
Dembiga afkooda iyo erayada bushimahooda aawadood,
Iyo weliba habaarka iyo beenta ay ku hadlaan aawadood.
13 Iyaga cadho ku baabbi'i, si aanay mar dambe u jirin
iyaga baabbi'i, Oo ha ogaadeen in Ilaah u taliyo reer
Yacquub Tan iyo dhulka darafkiisa. (Selaah) 14 Oo iyagu
fiidka ha soo noqdeen, oo sida eey oo kale ha u ciyeen,
Oo magaalada hareeraheeda ha ku warwareegeen. 15
Waxay u warwareegayaan inay cunto helaan, Oo haddaanay
dherginna habeenkii oo dhan way sii joogayaan. 16 Laakiinse
anigu waxaan ka gabyi doonaa xooggaaga, Haah, oo aroortii
ayaan naxariistaada aad uga gabyi doonaa, Waayo, waxaad
ahayd qalcaddaydii, Oo maalintii aan dhibaataysnaana
magangal baad ii ahayd. 17 Xooggaygiiyow, adigaan ammaan
kuugu gabyi doonaa, Waayo, Ilaah waa qalcaddayda, waana
Ilaaha naxariistayda.

**60** Ilaahow, adigu waad na xoortay, oo waad na dudumisay,
Oo waad nagu cadhootay, haddaba bal mar na soo
celi. 2 Dhulkii waad gariirisay, oo waad kala dildillaacisay,
Haddaba dildillaaciisa bogsii, waayo, wuu ruxmadaa. 3
Dadkaagii waxaad tustay waxyaalo adag, Oo waxaad na
cabsiisay khamri lala dhacdhaco. 4 Calan baad siisay kuwa
kaa cabsada, In runta loo soo bandhigo aawadeed. (Selaah)
5 Si ay kuwaad jeceshahay u samatabbaxaan, Gacantaada
midig ku badbaadi oo ii jawaab. 6 Ilaah wuxuu ku hadlay
quduusnimadiisa oo yidhi, Anigu waan farxi doonaa, Shekem
waan kala qaybin doonaa, oo waxaan qiyaasi doonaa
dooxada Sukod. 7 Gilecaad anigaa iska leh, Manasehna
anigaa iska leh, Oo weliba Efrayimna waa daafacaaddii
madaxayga, Yahuudahna waa ushayda boqornimo. 8
Moo'aab waa weelkaygii aan ku maydhan jiray, Edomna
kabahaygaan ku dul tuuri doonaa, Falastiinay, qayli aawaday.
9 Bal yaa i geeyn doona magaalada xoogga leh? Yaase xagga
Edom ii kaxayn doona? 10 Ilaahow, sow nama aadan xoorin?
Ilaahow, lama soo baxdid ciidammadayada. 11 Cadowga
naga caawi, Waayo, binu-aadmiga caawimaaddiisu waxtar
ma leh. 12 Ilaah caawimaaddiisa ayaannu wax xoog leh ku
samayn doonaa, Waayo, isagaa ah kan cadaawayaashayada
ku tuman doona.

61 Ilaahow, qayladayda maqal, Oo baryadaydana dhegta
u dhig. 2 Markii qalbigaygu itaal darnaado, waxaan
kaaga qayshan doonaa darafka dhulka ugu shisheeya, Ii
hoggaami dhagaxa iga dheer. 3 Waayo, waxaad ii ahayd
magangal, Iyo qalcad adag oo aan cadowga ka galo. 4 Anigu
weligayba waxaan degganaan doonaa taambuuggaaga,
Oo waxaan magangeli doonaa baalashaada meeshooda
qarsoon. (Selaah) 5 Waayo, Ilaahow, nidarradaydii waad
maqashay, Oo waxaad i siisay kuwa magacaaga ka cabsada
dhaxalkooda. 6 Boqorka noloshiisa waad dheeraynaysaa,
Oo cimrigiisuna wuxuu noqon doonaa sida qarniyo badan. 7
Oo weligiisba wuxuu joogi doonaa Ilaah hortiisa, Raxmad iyo
run u diyaari, inay isaga dhawraan. 8 Markaasaan weligayba
magacaaga ammaan ugu gabyi doonaa, Si aan maalin kasta
nidarradayda u oofiyo.

62 Naftaydu waxay sugtaa Ilaah oo keliya, Oo
badbaadadayduna waxay ka timaadaa xaggiisa. 2 Isaga
oo qudha ayaa dhagaxayga weyn iyo badbaadadaydaba
ah, Isagu waa munaaraddayda, oo aniga aad lay dhaqaajin
maayo. 3 Balse idinku ilaa goormaad nin ku weeraraysaan,
Inaad kulligiin isaga dumisaan, Sida derbi dhacaya, iyo
deyr ligliganaya? 4 Iyagu waxay keliyahoo ku tashadaan
si ay isaga sharaftiisa uga dejiyaan, Oo waxay ku farxaan
beensheegidda, Afka way ka duceeyaan, laakiinse uurka
way ka habaartamaan. (Selaah) 5 Naftaydoy, Ilaah oo qudha
sug, Waayo, isagaan wax ka filanayaa. 6 Isaga oo qudha
ayaa dhagaxayga weyn iyo badbaadadaydaba ah, Isagu
waa munaaraddayda, oo aniga layma dhaqaajin doono.
7 Badbaadadayda iyo ammaantayduba waxay la jiraan
Ilaah, Dhagaxii xooggayga iyo magangalkaygaba waa xagga
Ilaah. 8 Dadkow, isaga isku halleeya wakhti kastaba, Oo
qalbigiinna waxba ha kula hadhina Ilaah hortiisa, Waayo,
Ilaah baa magangal inoo ah. (Selaah) 9 Hubaal dad gun
ahu waa xumbo, Oo dad gob ahuna waa been, Markii la
miisaamo way kor mari doonaan, Oo iyagu dhammaantood
xumbo way ka fudud yihiin. 10 Dulmiga ha isku hallaynina,
Waxdhiciddana ha ku kibrina. Maal hadduu idinku batona
qalbigiinna ha raacinina. 11 Ilaah mar buu hadlay, Oo laba
goor baan maqlay, In Ilaah xoogga iska leeyahay, 12 Oo
weliba, Sayidow, adigu naxariis baad leedahay, Waayo, nin
kasta waxaad ugu abaalguddaa sidii camalladiisu ahaayeen.

63 Ilaahow, waxaad tahay Ilaahay, oo anna goor hore
ayaan ku doondooni doonaa, Naftaydu adigay kuu
oomman tahay, jidhkayguna aduu kuu xiisoodaa, Anoo jooga
dhul engegan oo daal miidhan ah oo aan biyo lahayn. 2 Si aan
u arko xooggaaga iyo ammaantaadaba aawadeed, Ayaan
kaa fiiriyey meesha quduuska ah. 3 Waayo, raxmaddaadu
way ka sii wanaagsan tahay nolol, Haddaba bushimahaygu
way ku ammaani doonaan. 4 Sidaas daraaddeed waan
kugu mahadnaqayaa intaan noolahay, Oo gacmahaygana
kor baan ugu qaadi doonaa magacaaga aawadiis. 5
Naftaydu waxay u dhergi doontaa sida mid dhuux iyo baruur
uga dhergo, Oo afkayguna wuxuu kugu ammaani doonaa
bushimo faraxsan 6 Kolkaan sariirtayda kugu soo xusuusto
Oo aan kaa fikiro habeenka markaan soo jeedo. 7 Waayo,
waxaad ii ahayd caawimaad, Oo hooska baalashaada ayaan
ku rayrayn doonaa. 8 Naftaydu adigay ku raacdaa, Oo
gacantaada midigna way i tiirisaa. (Selaah) 9 Laakiinse
kuwa naftayda u doondoonaya inay halligaan aawadeed,
Waxay geli doonaan dhulka meelaha ugu hooseeya. 10
Waxaa iyaga loo gacangelin doonaa xoogga seefta, Oo
waxay qayb u noqon doonaan dawacooyinka. 11 Laakiinse
boqorku wuxuu ku rayrayn doonaa Ilaah, Mid kasta oo isaga
ku dhaartaa wuu faani doonaa, Waayo, kuwa beenta sheega
afkooda waa la aamusiin doonaa.

64 Ilaahow, codkayga maqal markii aan kuu soo cawdo,
Oo naftayda ka ilaali cadowga cabsidiisa. 2 Oo iga
qari talada qarsoon oo kuwa sharka ka shaqeeya, Iyo
tirabadnaanta xumaanfalayaasha, 3 Oo carrabkooda u
afeeyey sidii seef oo kale, Oo fallaadhahoodii liishaamay
kuwaas oo ah erayo qadhaadh, 4 Si ay meelo qarsoon
kan qumman fallaadh ugaga ganaan, Haddiiba si kedis
ah ayay ugu ganaan, mana cabsadaan. 5 Qasdi shar
ah bay isku dhiirrigeliyaan, Waxay ku arrinsadaan inay si
qarsoon dabinno u dhigaan, Oo ay isyidhaahdaan, Bal yaa
arki doona? 6 Waxay baadhaan xumaatooyin, iyagoo leh,
Annagu baadhid caqli ah ayaannu ebinnay, Fikirka ku jira
uurka nin walba iyo qalbiguba waa mool dheer yihiin. 7
Laakiinse Ilaah waa toogan doonaa, Oo haddiiba iyaga
waxaa dhaawici doonta fallaadh. 8 Sidaas daraaddeed waa
la kufin doonaa, iyagoo carrabkoodu col u yahay naftooda,
Wax alla wixii iyaga arka oo dhammu way carari doonaan. 9
Oo dadka oo dhammu way cabsan doonaan, Oo waxay
sheegi doonaan shuqulka Ilaah, Oo si caqli ah ayay uga fikiri
doonaan wuxuu sameeyey. 10 Kuwa xaqa ahu waxay ku
farxi doonaan Rabbiga, oo isagay isku hallayn doonaan,
Oo inta qalbigoodu toosan yahay oo dhammuna way faani
doonaan.

65 Ilaahow, ammaan baa Siyoon kugu sugaysa, Oo
nidarkana waa in adiga laguu oofiyo. 2 Kaaga
baryootanka maqlow, Dadka oo dhammu adigay kuu
iman doonaan. 3 Waxaa iga adkaada xumaatooyin,

Xadgudubkayagase waad naga nadiifin doontaa. 4 Waxaa
barakaysan ninkii aad dooratid, oo aad ka dhigto inuu kuu
soo dhowaado, Inuu degganaado barxadahaaga. Waxaan ka
dhergi doonnaa wanaagga gurigaaga, Kaas oo ah meesha
quduuska ah oo macbudkaaga. 5 Ilaaha badbaadadayadow,
Waxyaalo cabsi badan ayaad xaqnimo noogu jawaabi
doontaa, Waxaad tahay kalsoonida kuwa dunida darfaheeda
oo dhan, Iyo kuwa badda fogba, 6 Kaas oo xooggiisa
buuraha ku adkeeya, Isagoo dhexda xoog ku xidhay. 7
Wuxuu aamusiiyaa guuxa badaha, iyo guuxa hirarkooda, Iyo
dadyowga buuqooda. 8 Oo weliba kuwa dhulka meelaha
ugu fog deggan waxay ka cabsadaan calaamooyinkaaga,
Oo adigu waad ka farxisaa meelaha ay subaxda iyo
fiidkaba ka baxaan. 9 Dhulka waad soo booqataa, oo
waad biyaysaa, Oo aad baad u barwaaqaysaa, Webiga
Ilaahna biyaa ka buuxa, Waxaad iyaga siisaa hadhuudh,
markii aad dhulka sidaas u diyaarisay. 10 Adigu beerta
jeexjeexeeda aad baad u waraabisaa, Oo waxaad dejisaa
jeexjeexa tuurahooda, Oo tiixtiix baad ku jilcisaa, Oo waxa
ka soo baxana waad barakaysaa. 11 Sannadda waxaad taaj
uga dhigtaa wanaaggaaga, Oo waddooyinkaagana waxaa
ka tifqa subag. 12 Waxay ku tifqaan daaqa cidlada, Oo
buuruhuna waxay guntadaan farxad. 13 Berrimmada daaqu
waxay huwadaan tirooyin adhyo ah, Dooxooyinkana waxaa
qariya hadhuudh, Markaasay farxad la qayliyaan, oo weliba
gabyaan.

**66** Dadka dhulka oo dhammow, Ilaah farxad ugu qayliya,
2 Oo ammaanta magiciisa ku gabya, Ammaantiisana
qurxiya. 3 Ilaah waxaad ku tidhaahdaan, Shuqulladaadu
cabsi badanaa! Weynaanta xooggaaga aawadiis ayaa
cadaawayaashaadu isugu kaa dhiibi doonaan. 4 Dadka
dhulka oo dhammu adigay ku caabudi doonaan, Wayna kuu
gabyi doonaan, Magacaagay u gabyi doonaan. (Selaah)
5 Bal kaalaya, oo arka shuqullada Ilaah, Xagga binu-
aadmiga wuxuu ku sameeyey waa cabsi badan yihiin. 6
Wuxuu baddii ka dhigay dhul engegan, Oo iyagu webiga
dhexdiisa waxay ku mareen lug, Oo halkaasaan isaga ku
rayraynay. 7 Isagu weligiisba wuxuu ku taliyaa xooggiisa, Oo
indhihiisuna waxay fiiriyaan quruumaha, Haddaba caasiyiintu
yaanay kor isu qaadin. (Selaah) 8 Dadyahow, Ilaaheenna
ammaana, Oo codka ammaantiisa ha la maqlo, 9 Kaasoo
nafteenna nolol ku haya, Oo cagaheennana aan u oggolayn
in la dhaqdhaqaajiyo. 10 Waayo, Ilaahow, adigu waad na
imtixaantay, Oo waxaad noo tijaabisay sida lacagta loo
tijaabiyo. 11 Waxaad na gelisay shabagga dabinka ah,
Oo waxaad simaha naga saartay culaab weyn. 12 Dad
baad madaxa naga saartay, Oo waxaannu dhex galnay
dab iyo biyo, Laakiinse ugudambaysta waxaad na keentay
meel barwaaqo ah. 13 Haddaba anigu gurigaaga waxaan
la soo geli doonaa allabaryo la gubo, Oo waxaan kuu
oofinayaa nidarradaydii 14 Bushimahaygu ay ku hadleen, Oo
afkaygu sheegay markii aan dhibaataysnaa. 15 Oo waxaan
allabaryo la gubo kuugu soo bixinayaa xoolo buurbuuran Iyo
wanan iyo fooxood, Oo waxaan kuu soo bixin doonaa dibiyo
iyo orgiyo. (Selaah) 16 Kulli intiinna Ilaah ka cabsataay,
kaalaya oo maqla, Oo waxaan sheegayaa wuxuu naftayda u
sameeyeye. 17 Isagaan afkayga ugu qayshaday, Oo waxaan
ku ammaanay carrabkayga. 18 Haddaan dembi qalbigayga
ku arkay, Sayidku ima uu maqleen, 19 Laakiinse sida runta
ah Ilaah waa i maqlay, Oo codkii baryadaydana dhegtuu u
dhigay. 20 Mahad waxaa leh Ilaaha Aan baryadayda diidin
oo aan naxariistiisana gees iga marin.

**67** Ilaahow, noo naxariiso, oo na barakee, Oo wejigaaguna
ha na iftiimiyo, (Selaah) 2 In jidkaaga laga ogaado
dhulka, Quruumaha oo dhan dhexdoodana laga wada
ogaado caafimaadkaaga wax badbaadiya. 3 Ilaahow,
dadyowgu ha ku ammaaneen, Dadyowga oo dhammu ha
ku ammaaneen. 4 Quruumuhu ha farxeen oo ha gabyeen
farxad aawadeed, Waayo, dadyowga waxaad ku xukumi
doontaa caddaalad, Oo quruumahana dhulkaad ugu talin
doontaa. (Selaah) 5 Ilaahow, dadyowgu ha ku ammaaneen,
Dadyowga oo dhammu ha ku ammaaneen. 6 Dhulku wuxuu
soo saaray midhihiisii, Waxaa ina barakayn doona Ilaah, oo
ah Ilaaheenna qudhiisa. 7 Ilaah waa ina barakayn doonaa,
Oo dhulka darafyadiisa oo dhammuna way ka cabsan
doonaan isaga.

**68** Ilaah ha sara joogsado, oo cadaawayaashiisuna ha
kala firdheen, Kuwa necebuna hortiisa ha ka carareen.
2 Sida qiiqu u kala firdho, iyagana sidaasoo kale u kala
firdhi, Sida shamacu dabka ugu dhalaalo, Sidaasoo kale
kuwa sharka lahu Ilaah hortiisa ha ku baabbe'een. 3
Laakiinse kuwa xaqa ahu ha farxeen, oo Ilaah hortiisa
ha ku reyreeyeen, Haah, oo farxad ha ku reyreeyeen.
4 Ilaah u gabya, oo magiciisa ammaan ugu gabya, Kan
lamadegaanka dhex mara jid weyn u fala, Magiciisu waa
Yaah, ee hortiisa ku reyreeya. 5 Ilaah wuxuu rugtiisa
quduuskaa ku yahay Agoonta aabbahood iyo carmallada
xaakinkooda. 6 Kuwa cidlaysan Ilaah reero ayuu u yeelaa,
Oo maxaabiistana intuu soo bixiyo ayuu barwaaqo dhex
geeyaa, Laakiinse caasiyiintu waxay degganaadaan dhul
oommane ah. 7 Ilaahow, markaad dadkaaga hor kacday,
Markaad lamadegaanka ku dhex socotay, (Selaah) 8 Dhulku

waa gariiray, Samooyinkuna waxay ku de'een Ilaah hortiisa,
Xataa Buur Siinay nafteedu waxay ka gariirtay Ilaah hortiisa,
kaasoo ah Ilaaha Israa'iil. **9** Ilaahow, waxaad soo daysay
roob badan, Oo kuwa dhaxalkaagu markay daallanaayeenna
waad xoogaysay. **10** Ururkaagu halkaasuu dhex degganaa,
Ilaahow, wanaaggaaga aawadiis wax baad u diyaarisay
masaakiinta. **11** Sayidku wuxuu bixiyey erayga, Kuwa warka
faafiyaana waa guuto weyn. **12** Boqorrada ciidammadu way
cararaan, way cararaan, Oo tan guriga ku hadha ayaa dhaca
qaybisa. **13** Xeryaha idaha miyaad iska dhex jiifaysaan, Sidii
baadad qoolley oo lacag lagu dahaadhay, Iyo baalasheeda
oo dahab cas lagu dahaadhay? **14** Markii Qaadirku boqorrada
halkaas ku kala dhex firdhiyey, Waxay ahayd sida marka
baraf cad ku da'o Salmoon. **15** Buur Ilaah waxaa ah Buur
Baashaan. Oo buur dheer waxaa ah Buur Baashaan. **16**
Buurihiinnan dhaadheerow, bal maxaad u quudhsanaysaan
Buurta Ilaah uu jeclaaday inuu hoygiisii ka dhigto? Haah, oo
Rabbigu halkaasuu degganaan doonaa weligiisba. **17** Ilaah
gaadhifardoodyadiisu waa labaatan kun, iyo xataa kumanyaal
iyo kumaankun, Sayidku wuu ku dhex jiraa iyaga, siduu
Siinay ugu jiri jiray xagga meesha quduuska ah. **18** Adigu
kor baad u baxday, oo waxaad qabatay oo kaxaysay kuwii
maxaabiista ahaan jiray. Oo waxaad hadiyado ka qaadatay
dadka dhexdiisa, Iyo xataa caasiyiintaba, in Rabbiga Ilaah
ahu halkaas joogo aawadeed. **19** Waxaa mahad leh Sayidka
maalin kasta culaabteenna inoo qaada, Kaasoo ah Ilaaha
ina badbaadiya. (Selaah) **20** Ilaah wuxuu inoo yahay Ilaaha
samatabbixinta, Ilaaha Sayidka ah ayaa iska leh dhimashada
kabixiddeeda. **21** Laakiinse Ilaah wuxuu wax ku dhufan
doonaa madaxa cadaawayaashiisa, Iyo dhalada timaha leh
oo kan xadgudubyadiisa ku sii socdaba. **22** Sayidku wuxuu
yidhi, Waxaan iyaga ka soo celin doonaa xagga Baashaan,
Oo waxaan ka soo bixin doonaa badda moolkeeda, **23** Inaad
cagtaada dhiig darsatid, Iyo in eeyahaaga carrabkoodu uu
qayb ka helo cadaawayaashaada. **24** Ilaahow, waxay arkeen
tegiddaadii, Taas oo ah tegiddii Ilaahay oo ah Boqorkayga
oo uu galay meesha quduuska ah. **25** Gabayayaashii way
hor mareen, muusikaystayaashiina way raaceen, Dhexdana
waxaa ku jiray hablo daf ku cayaaraya. **26** Kuwiinnan isha
Israa'iil ka soo farcamayow, Shirarka ku dhex ammaana
Ilaaha Sayidka ah. **27** Waxaa jooga Benyaamiin yar oo ah
taliyahooda, Iyo amiirrada reer Yahuudah iyo guddigooda,
Iyo amiirrada reer Sebulun iyo amiirrada reer Naftaali.
**28** Ilaahaagu xooggaaguu amray, Ilaahow, waxaad noo
samaysay noo xoogee. **29** Macbudkaaga Yeruusaalem ku
yaal daraaddiis Ayaa boqorro waxay kuugu keeni doonaan
hadiyado. **30** Canaano dugaagga cawsduurka ku dhex jira,
Iyo dibida tirada badan, iyo weylaha dadka Oo ku tumanaya
lacagta gogo'a ah, Isagu wuu kala firdhiyey dadyowga
dagaalka jecel. **31** Masar waxaa ka iman doona amiirro,
Itoobiyana haddiiba gacmaheeday u hoorsan doontaa Ilaah.
**32** Boqortooyooyinka dhulkow, Ilaah u gabya, Ammaan ugu
gabya Sayidka, (Selaah) **33** Kaasoo kor fuushan samada
samooyinka sare, oo weligoodba jiray, Bal eega, wuxuu
ku hadlaa codkiisa, oo weliba codkiisu waa xoog badan
yahay. **34** Ilaah xoog ka sheega, Waayo, sharaftiisu waxay
dul joogtaa reer binu Israa'iil, Oo xooggiisuna wuxuu ku jiraa
samooyinka. **35** Ilaahow, meelahaaga quduuska ah waxaad
ka tahay mid laga cabsado, Ilaaha reer binu Israa'iil wuxuu
dadkiisa siiyaa xoog iyo itaal. Mahad waxaa leh Ilaah.

**69** Ilaahow, i badbaadi, Waayo, biyaa naftii ii keenay.
**2** Waxaan ku dhex liimbadaa dhoobo mool dheer
oo aan lahayn meel laysku taago, Waxaan ku dhacay
biyo mool dheer, oo daad baa halkaas igu qarqinaya.
**3** Waxaan ku daalay qayladaydii, oo hungurigaygu waa
qallalay, Oo intii aan Ilaahay sugayo ayay indhahaygu
dem yidhaahdaan. **4** Kuwa sababla'aanta ii nebcaadaa
way ka sii badan yihiin timaha madaxayga, Kuwa doonaya
inay i baabbi'iyaan iyagoo cadaawayaashayda gardarro igu
ah waa xoog badan yihiin, Markaasaan magdhabay wax
aanan qaadan. **5** Ilaahow, waad og tahay nacasnimadayda,
Oo dembiyadayduna kaama qarsoona. **6** Sayidow, Ilaaha
ciidammadow, kuwa ku sugaya yaanan ceeb u soo jiidin,
Ilaaha reer binu Israa'iilow, kuwa ku doondoonaya yaanan
sharafjab u soo jiidin. **7** Maxaa yeelay, adiga daraaddaa
ayaan cay u qaaday, Oo waxaa wejigaygii ka muuqatay
ceeb. **8** Waxaan walaalahay u noqday shisheeye, Oo
ilma hooyadayna waxaan u noqday ajanabi. **9** Qiiradii aan
gurigaaga u qabay ayaa i gubtay, Oo caydii kuwii ku caayay
ayaa igu kor dhacday. **10** Markaan ooyay, oo aan naftayda
soon ku edbiyey, Taasu waxay igu noqotay ceeb. **11** Markaan
joonyado dhar ka dhigtayna, Waxaan iyagii u noqday masaal.
**12** Kuwa iridda fadhfadhiyaa way igu sheekaystaan, Oo kuwa
sakhraanka ahuna way igu gabyaan. **13** Laakiinse adigaan
ku baryayaa wakhti la aqbali karo, Rabbiyow, Ilaahow,
naxariistaada badan Iyo runta badbaadintaada iigu jawaab.
**14** Dhoobada iga samatabbixi, oo yaanan ku liimban, Oo
ha layga samatabbixiyo kuwa i neceb, iyo biyaha moolka
dheer. **15** Biyaha daadka ahuna yaanay i qarqin, Oo yaan
moolku i liqin, Oo yamayskuna yaanu afkiisa igu qabsan. **16**
Rabbiyow, ii jawaab, waayo, raxmaddaadu waa wanaagsan
tahay, Naxariistaada badnaanteeda aawadeed iigu soo
jeeso. **17** Oo wejigaaga ha iga qarin anoo addoonkaaga ah,

Waayo, waan dhibaataysnahay, ee haddiiba ii jawaab. 18
Naftayda u soo dhowow, oo furo, Oo cadaawayaashayda
daraaddood ii samatabbixi. 19 Waad og tahay caydayda iyo
ceebtayda iyo sharafdarradayda, Oo cadaawayaashayda
oo dhammu hortaaday joogaan. 20 Cay baa i qalbi jebisay,
waanan quusanayaa, Oo waxaan doondoonay mid ii jixinjixa,
laakiinse waan waayay, Oo waxaan doondoonay kuwo i
qalbi qaboojiya, laakiinse ma aanan helin. 21 Oo weliba
waxay cunto ahaan ii siiyeen xammeeti, Oo markaan
harraadsanaana waxay i cabsiiyeen khal. 22 Miiskoodu
hortooda ha ku noqdo dabin, Oo markay nabdoon yihiinna
shirqool ha ku noqdo. 23 Indhahoodu ha madoobaadeen si
aanay waxba u arkin, Oo simahooduna had iyo goorba ha
gariireen. 24 Xanaaqaaga iyaga ku deji, Oo cadhadaada
kulaylkeeduna ha qabsado. 25 Gurigoodu cidla ha noqdo,
Ninnana yaanu teendhooyinkooda degin, 26 Waayo, iyagu
waxay silciyaan kii aad dishay, Oo waxay ka sheekeeyaan
kuwaad dhaawacday murugtooda. 27 Xumaantooda xumaan
ugu sii dar, Oo yaanay xaqnimadaada soo gelin. 28
Magacooda ha laga tirtiro kitaabka kuwa nool, Oo yaan iyaga
lala qorin kuwa xaqa ah. 29 Laakiinse anigu miskiin baan
ahay, waanan murug badnahay, Ilaahow, badbaadintaadu
meel sare ha i saarto. 30 Rabbiga magiciisa ayaan gabay ku
ammaani doonaa, Oo waxaan isaga ku weynayn doonaa
mahadnaqid. 31 Oo taasuna Rabbiga way ka farxin doontaa
in ka sii wanaagsan intii uu ku farxi lahaa dibi, Ama dibi sange
ah oo geeso iyo qoobab leh. 32 Kuwa camal qabow way
arkeen, waana faraxsan yihiin, Kuwiinna Ilaah doondoonow,
qalbigiinnu ha noolaado. 33 Waayo, Rabbigu wuu maqlaa
kuwa baahan, Oo maxaabiistiisana ma uu quudhsado. 34
Samada, iyo dhulka, iyo badaha, Iyo waxa ku dhex dhaqaaqa
oo dhammuba isaga ha ammaaneen. 35 Waayo, Ilaah Siyoon
wuu badbaadin doonaa, oo magaalooyinka reer Yahuudahna
wuu dhisi doonaa, Oo iyana halkaasay degi doonaan, oo
hanti ahaan bay u lahaan doonaan. 36 Oo weliba waxaa
halkaas dhaxli doona farcanka addoommadiisa, Oo kuwa
magiciisa jecelna way dhex degganaan doonaan.

**70** Ilaahow, soo dhaqso oo i samatabbixi, Rabbiyow, soo
dhaqso oo i caawi. 2 Kuwa doondoonaya inay naftayda
iga qaadaan Ha ceeboobeen oo ha wareereen, Oo kuwa
waxyeelladayda ku farxaana Dib ha u noqdeen oo ha sharaf
beeleen. 3 Kuwa Ahaa, Ahaa, lahu, Ceebtooda dib ha ula
noqdeen. 4 Kuwa adiga ku doondoona oo dhammu ha
reyreeyeen oo ha kugu farxeen, Oo kuwa badbaadintaada
jeceluna had iyo goorba ha yidhaahdeen, Ilaah ha la
weyneeyo. 5 Laakiinse miskiin iyo mid baahan baan ahay,
Ilaahow, ii soo dhaqso, Waxaad tahay caawimaaddayda iyo
samatabbixiyahayga. Rabbiyow, ha iga raagin.

**71** Rabbiyow, adigaan isku kaa halleeyaa, Yaanan weligay
wareerin. 2 Xaqnimadaada igu samatabbixi oo i nabad
geli, Dhegta ii dhig, oo i badbaadi. 3 Ii noqo dhagax weyn
oo rug ah, oo aan had iyo goorba ku noqnoqdo, Waxaad
amar ku bixisay in lay badbaadsho, Waayo, adigu waxaad
tahay dhagax weyn oo ii gabbaad ah iyo qalcaddayda. 4
Ilaahayow, iga badbaadi kan sharka leh gacantiisa, Iyo
gacanta xaqlaawaha iyo ninka nacabkaa. 5 Waayo, Sayidow
Ilaahow, waxaad tahay rajadayda, Oo waxaad tahay kii
aan isku hallaynayay tan iyo yaraantaydii. 6 Tan iyo uurkii
hooyaday adigaa i tiirinayay, Waxaad tahay kii iga soo
bixiyey uurkii hooyaday, Had iyo goorba adigaan ku ammaani
doonaa. 7 Anigu kuwo badan baan u ahay sidii wax yaab leh,
Laakiinse adigu waxaad ii tahay magangal xoog leh. 8 Maalin
kasta waxaa afkayga ka buuxi doona Ammaantaada iyo
sharaftaada. 9 Ha i tuurin markaan gaboobo, Oo ha i dayrin
markaan itaal darnaado. 10 Waayo, cadaawayaashaydu
waxay ka hadlaan wax igu saabsan, Oo kuwa naftayda inay
iga qaadaan doonayaana way wada arrinsadaan, 11 Oo
waxay isyidhaahdaan, Ilaah baa dayriyey, Haddaba ka daba
taga oo qabta, waayo, ma jiro mid samatabbixinayaa. 12
Ilaahow, ha iga fogaan, Ilaahayow, soo dhaqso oo i caawi.
13 Kuwa naftayda cadaawayaal ku ahu ha ceeboobeen oo
ha baabba'een, Oo kuwa waxyeelladayda doondoonayana
ceeb iyo sharafdarro ha ku bateen. 14 Laakiinse anigu
had iyo goorba wax baan rajaynayaa, Oo weliba waan
kuu sii ammaanayaa aad iyo aad. 15 Afkaygu wuxuu
maalinta oo dhan ka sheekayn doonaa xaqnimadaada, iyo
badbaadintaada, Waayo, anigu ma aqaan intay tiro le'eg
yihiin. 16 Waxaan la imanayaa Sayidka Ilaahaa shuqulladiisa
xoogga leh, Oo waxaan ka hadli doonaa xaqnimadaada,
taasoo ah taada oo keliya. 17 Ilaahow, wax baad i bari jirtay
tan iyo yaraantaydii, Oo ilaa haatanna waxaan caddayn
jiray shuqulladaada yaabka badan. 18 Ilaahow, ha i dayrin,
xataa markaan gaboobo oo madaxaygu cirroobo, Jeeraan
xooggaaga uga warramo farcanka dambe Oo aan itaalkaaga
uga sheekeeyo mid kasta oo hadda ka dib imanaya. 19
Ilaahow, xaqnimadaadu aad iyo aad bay u sarraysaa,
Ilaahow, adiga oo waxyaalaha waaweyn sameeyey, Bal yaa
kula mid ah? 20 Adiga oo na tusay dhibaatooyin badan oo aad
u xun, Ayaa haddana na noolayn doona, Oo haddana waxaad
naga soo saari doontaa dhulka moolkiisa. 21 Weynaantayda
ii sii kordhi, Oo intaad soo jeesatid i qalbi qabooji. 22
Ilaahow, waxaan kugu ammaani doonaa alaab muusiko ah,

Oo runtaadaan ammaani doonaa, Israa'iil kiisa Quduuska
ahow, Waxaan ammaan kuugula gabyi doonaa kataarad.
23 Bushimahaygu aad bay ugu farxi doonaan, markaan
ammaan kuugu gabyo, Oo xataa naftaydii aad soo furatayna
way rayrayn doonta. 24 Oo weliba carrabkayguna maalinta
oo dhan wuxuu ka sheekayn doonaa xaqnimadaada, Waayo,
kuwa waxyeelladayda doondoonayaa way ceeboobaan, oo
way isku wareeraan.

72 Ilaahow, boqorka xukummadaada sii, Oo wiilka
boqorkana xaqnimadaada sii. 2 Isagu dadkaaga
wuxuu ku xukumi doonaa xaqnimo, Oo masaakiintaadana
caddaalad. 3 Buuruhu waxay dadka u keeni doonaan nabad,
Kuruhuna waxay nabad ugu keeni doonaan xaqnimada. 4
Isagu wuxuu u garsoori doonaa dadka masaakiintiisa, Oo
wuxuu badbaadin doonaa ka baahan carruurtiisa, Oo kan
wax dulmana cadcad buu u kala jejebin doonaa. 5 Way
kaa cabsan doonaan inta qorraxdu jirto, Iyo inta dayaxu jiro
tan iyo ka ab ka ab. 6 Isagu wuxuu u soo degi doonaa
sida roob caws la jaray ku dul hoora, Iyo sida tiixyo dhulka
biyeeya. 7 Wakhtigiisa ayaa kan xaqa ahu barwaaqoobi
doonaa, Oo nabadduna way badan doontaa tan iyo inta
dayaxu aanu mar dambe jiri doonin. 8 Oo isagu wuxuu u talin
doonaa bad ilaa ka bad, Iyo tan iyo Webiga iyo ilaa dhulka
darfihiisa. 9 Kuwa cidlada degganu hortiisay ku sujuudi
doonaan; Oo cadaawayaashiisuna ciidday leefleefi doonaan.
10 Boqorrada Tarshiish iyo kuwa gasiiraduhuba waxay isaga
u keeni doonaan gabbaro, Boqorrada Shebaa iyo kuwa
Sebaana waxay isaga siin doonaan hadiyado. 11 Haah, oo
boqorrada oo dhammu hortiisay ku wada sujuudi doonaan,
Oo quruumaha oo dhammuna isagay u adeegi doonaan.
12 Waayo, isagu wuxuu samatabbixin doonaa kan baahan
markuu qayliyo, Iyo miskiinka aan mid caawiya lahayn. 13
Wuxuu u nixi doonaa miskiinka iyo kan baahan, Oo kuwa
baahan naftoodana wuu badbaadin doonaa. 14 Naftooduu ka
furan doonaa khiyaano iyo dulmi, Oo dhiiggooduna hortiisuu
qaali ku ahaan doonaa, 15 Oo isagu wuu noolaan doonaa,
oo waxaa la siin doonaa dahabka Shebaa; Had iyo goorba
dadku way u ducayn doonaan, Oo weliba maalinta oo dhan
isagay ammaani doonaan. 16 Oo dhulka waxaa jiri doona
hadhuudh badan xagga buuraha dushooda, Oo midhihiisuna
waxay u soo ruxmi doonaan sida Lubnaan oo kale, Oo kuwa
magaalada joogaana waxay u barwaaqoobi doonaan sida
doogga dhulka. 17 Magiciisu weligiis buu waari doonaa,
Magiciisu waa sii jiri doonaa in alla intay qorraxdu jirto; Oo
dadku way ku barakoobi doonaan isaga, Quruumaha oo
dhammuna waxay ugu yeedhi doonaan farxaan. 18 Mahad
waxaa leh Rabbiga Ilaahaa oo ah Ilaaha reer binu Israa'iil,
Oo keligiis sameeya waxyaalo yaab badan, 19 Magiciisa
ammaanta badanu mahad ha lahaado weligiisba, Oo dhulka
oo dhanna ammaantiisu ha ka buuxsanto. Aamiin iyo Aamiin.
20 Daa'uud ina Yesay baryootannadiisii way dhammaadeen.

73 Hubaal Ilaah waa u roon yahay reer binu Israa'iil, Iyo
xataa kuwa qalbigoodu daahirka yahay. 2 Laakiinse
anigu waan turunturoon gaadhay, Oo tallaabooyinkayguna
waxay u dhowaadeen inay simbiriirixdaan. 3 Waayo, waxaan
ka hinaasay kuwa qabka weyn, Markaan arkay barwaaqada
ay kuwa sharka lahu haystaan. 4 Waayo, geeridoodu xanuun
ma leh, Laakiinse xooggoodu waa adag yahay. 5 Iyagu
dhib kuma jiraan sida dadka kale, Oo sida dadka kalena
uma belaayaysna. 6 Sidaas daraaddeed kibir wuxuu yahay
sida silsilad qoorta u sudhan, Oo dulmi bay sida maro u
huwan yihiin. 7 Indhahoodu baruur bay la bararsan yihiin, Oo
waxay haystaan in ka sii badan waxa qalbigoodu doonayo.
8 Wax bay ku qoslaan, oo xumaan daraaddeed dulmi bay ku
hadlaan, Waxay hadlaan iyagoo kor isu qaadaya. 9 Afkoodii
waxay gaadhsiiyeen samooyinka, Oo carrabkooduna wuxuu
dhex maraa dhulka oo dhan. 10 Sidaas daraaddeed dadkiisii
halkanay ku soo noqdaan, Oo koob biyo ka buuxa ayay
madhsadeen. 11 Oo waxay yidhaahdaan, Ilaah sidee buu
wax u yaqaan? Kan ugu sarreeyana aqoonu ma ku jirtaa?
12 Bal eeg, kuwanu waa kuwa sharka leh, Oo mar kasta
iyagoo istareexsan ayay hodantinimadoodu sii korodhaa.
13 Hubaal wax aan micne lahayn ayaan qalbigaygii ku
nadiifshay, Oo aan ku faraxashay anigoo aan eed lahayn,
14 Waayo, maalintii oo dhan waa lay dhibayay, Oo subax
kastana waa lay edbinayay. 15 Haddaan odhan lahaa,
Sidaasaan ku hadli doonaa, Bal eeg, waan khiyaanayn
lahaa farcanka carruurtaada. 16 Markaan ku fikiray si aan
tan ku ogaado, Aad bay iigu xanuun badnayd, 17 Ilaa aan
galay meesha quduuska ah ee Ilaah, Oo aan ka fiirsaday
ugudambaystooda. 18 Hubaal waxaad iyaga ku taagtaa
meelo sibiibix ah, Oo waxaad hoos ugu tuurtaa si ay u
baabba'aan. 19 Sidee bay daqiiqad ugu noqdeen meel
cidla ah! Dhammaantood waxay ku baabba'een cabsi. 20
Sayidow, sidii mid riyo ka toosay Markaad toostid, waxaad
quudhsan doontaa ekaantooda. 21 Waayo, qalbigaygu wuu
murugooday, Oo waxaa layga muday kelyaha, 22 Waxaan
ahaa doqon iyo jaahil, Oo hortaada waxaan ku ahaa sidii
xoolo oo kale. 23 Habase yeeshee had iyo goorba waan kula
joogaa, Oo waxaad i qabatay gacanta midig. 24 Waxaad igu
hoggaamin doontaa taladaada, Oo dabadeedna waxaad
igu dhowayn doontaa ammaanta. 25 Bal, yaan samada

ku leeyahay adiga mooyaane? Oo dhulkana laguma arko
mid aan kaa jeclahay. 26 Jiidhkayga iyo qalbigayguba waa
itaal darnaadeen, Laakiinse Ilaah wuxuu weligiis ii yahay
xooggii qalbigayga iyo qaybtayda. 27 Waayo, bal eeg, kuwa
kaa fogu way halligmi doonaan, Oo waad wada baabbi'isay
kuwii kaa caasiyoobay oo dhan. 28 Laakiinse aniga waxaa ii
roon inaan Ilaah u soo dhowaado, Waayo, Sayidka Ilaahaa
waxaan ka dhigtay magangalkayga, Inaan ka sheekeeyo
shuqulladaada oo dhan.

**74** Ilaahow, bal maxaad weligaaba noo xoortay?
Oo bal maxaa cadhadaadu ugu kululaataa idaha
daaqsintaada? 2 Bal soo xusuuso ururkaaga aad waa hore
soo iibsatay, Oo aad u soo furatay inay ahaadaan qabiilkaad
dhaxashay, Oo weliba Buur Siyoon oo aad degganaatana soo
xusuuso. 3 Tallaabooyinkaaga u soo qaad xagga baabba'a
weligiis ah, Iyo xagga xumaanta uu cadowgu meesha
quduuska ah ku sameeyey oo dhan. 4 Cadaawayaashaadii
waxay ka qayliyeen shirkaaga dhexdiisa, Oo waxay calaamad
ahaan u qotonsadeen calammadoodii. 5 Waxay u ekaadeen
sidii niman faasas u qaatay hawd jiq ah. 6 Haddaba
shuqulkiisii la qoray oo dhan Waxay ku wada dumiyaan
gudmo iyo dubbayaal. 7 Meeshaada quduuska ah dab bay ku
dhejiyeen, Oo waxay wada nijaaseeyeen meeshii magacaaga
hoyga u ahayd. 8 Waxay qalbigooda iska yidhaahdeen,
Kaalaya aan dhammaantood baabbi'innee, Waxay wada
gubeen sunagogyadii Ilaah oo dalka ku dhex yiil oo dhan.
9 Annagu calaamadahayagii ma aragno, Oo innaba mar
dambe nebi ma jiro, Dhexdayadana ma joogo mid garanaya
ilaa goorma. 10 Ilaahow, ilaa goormaa cadowgu caytamayaa?
Cadowgu miyuu magacaaga caayayaa weligiisba? 11 Bal
maxaad gacantaada midig dib ugu celisaa? Laabtaada ka
soo bixi oo iyaga baabbi'i. 12 Laakiinse Ilaah waa boqorkayga
tan iyo waa hore, Isagoo badbaadin ka dhex samaynaya
dhulka. 13 Xooggaagaad badda ku kala qaybisay, Oo
masbadeedyada ku dhex jirana madaxaad ka jebisaa. 14
Waxaad kala burburisay madaxyada bahalbadeedyada oo
Lewiiyaataan la odhan jiray, Oo cunto ahaan ayaad u siisay
dadkii cidlada degganaa. 15 Waxaad kala furtay ilo iyo
durdurro, Oo waxaad qallajisay webiyo waaweyn. 16 Maalinta
adigaa iska leh, habeenkana adigaa iska leh, Oo adigaa
diyaariyey iftiinka iyo qorraxdaba. 17 Adigu waxaad samaysay
dhulka soohdimihiisa oo dhan, Oo adigaa sameeyey diraac
iyo xagaaba. 18 Rabbiyow, xusuuso in cadowgu caytamay,
Iyo in dad nacas ahu magacaaga caayay. 19 Qoolleydaada
nafteeda ha u gacangelin dugaagga, Weligaaba ha illoobin
nafta masaakiintaada, 20 Bal soo fiiri axdigaaga, Dhulka
meelihiisa gudcurka ah waxaa ka buuxa hoyaalka dulmiga.
21 Kuwa la dulmay yaanay dib u noqon iyagoo ceeboobay,
Miskiinka iyo kan baahanu magacaaga ha ammaaneen.
22 Ilaahow, sara joogso, oo dacwadaada u muddac. Bal
xusuuso siday dadka nacaska ahu maalinta oo dhan kuu
caayaan. 23 Ha illoobin codka cadaawayaashaada, Kuwa
kugu kaca buuqoodu had iyo goorba wuu soo kacaa.

**75** Ilaahow, adaan kuu mahadnaqnaa, Waannu kuu
mahadnaqnaa, waayo, magacaagu waa noo dhow
yahay, Dadku waxay ka sheekeeyaan shuqulladaada yaabka
badan. 2 Wakhtiga aan qawimay, Ayaan si qumman wax u
xukumi doonaa. 3 Dhulka iyo waxa kor deggan oo dhammuba
way wada dhalaaleen, Tiirarkiisa anigaa qotomiyey. (Selaah)
4 Kuwa kibirka leh waxaan ku idhi, Ha kibrina, Kuwa sharka
lehna waxaan ku idhi, Geeskiinna kor ha u taagina, 5
Geeskiinna kor ha u taagina, Oo madaxadayg ha ku hadlina.
6 Waayo, sarrayntu kama timaado xagga bari ama xagga
galbeed, Ama xataa xagga koonfureed toona. 7 Laakiinse
Ilaah baa xaakin ah, Isagu mid buu dejiyaa, ku kalena wuu
sarraysiiyaa. 8 Waayo, Rabbiga gacantiisa waxaa ku jira
koob, oo waxaa ka xumbaynaysa khamri, Oo waxaa ka
buuxa wax laysku qooshay, oo kaasuu wax ka shubaa,
Hubaal huubadiisa waxaa heenheensan doona oo cabbi
doona dunida kuweeda sharka leh oo dhan. 9 Laakiinse
anigu weligayba waan rayrayn doonaa, Oo waxaan ammaan
ugu gabyi doonaa Ilaaha Yacquub. 10 Oo weliba kuwa
sharka leh geesahooda oo dhan waan wada jejebin doonaa,
Laakiinse kuwa xaqa ah geesahooda waa la sarraysiin
doonaa.

**76** Ilaah baa reer Yahuudah lagu dhex yaqaan, Oo
magiciisuna reer binu Israa'iil dhexdooda waa ku
weyn yahay. 2 Oo taambuuggiisu wuxuu ku yaal Saalem,
Hoygiisuna wuxuu ku yaal Siyoon. 3 Oo halkaas wuxuu ku
jejebiyey fallaadhihii qaansada, Iyo gaashaankii, iyo seeftii,
iyo dagaalkiiba. (Selaah) 4 Adigu waxaad ka ammaan iyo
haybad badan tahay buuraha ugaadha leh. 5 Kuwii qalbiga
adkaa waa la dhacay, oo hurdadoodii ayay wada gam'een,
Oo raggii xoogga badnaana midkoodna gacmihiisii waxba
kuma samayn. 6 Ilaaha Yacquubow, canaantaadii aawadeed
Ayaa gaadhifardood iyo fardoba waxay kula dhex dheceen
hurdo weyn. 7 Adigase waa in lagaa cabsadaa, Bal yaa
hortaada istaagi kara mar haddaad cadhootid? 8 Waxaad
ka dhigtay in xukun samada laga maqlo, Oo dhulkiina waa
baqay, oo wuu aamusay, 9 Markuu Ilaah xukunka u sara
kacay Inuu badbaadsho kuwa camalka qabow oo dhulka
jooga oo dhan. (Selaah) 10 Hubaal waxaa ku ammaani
doonta dadka cadhadiisa, Oo waxaad dhexda ku xidhan

doontaa cadhada inteeda hadhay. 11 Rabbiga Ilaahiin ah
wax u nidra, oo u oofiya, Inta hareerihiisa ku wareegsan oo
dhammu isaga hadiyado ha u keeneen kan ay waajibka
tahay in laga cabsado. 12 Isagu wuxuu gooyn doonaa
amiirrada ruuxooda, Boqorrada dunidana wuu u cabsi badan
yahay.

**77** Anigu codkaygaan Ilaah ugu qayshan doonaa, Xataa
Ilaah ayaan codkayga ugu qayshan doonaa, oo isaguna
wuu i dhegaysan doonaa. 2 Maalintii aan dhibaataysnaa
waxaan doondoonay Sayidka, Gacantaydu way fidsanayd
habeennimadii, mana ay nasan, Oo naftaydiina way
diidday in la qaboojiyo. 3 Waxaan soo xusuustaa Ilaah,
markaasaan welwelaa, Waan cawdaa, markaasay naftaydu
taag darnaataa. (Selaah) 4 Indhahaygii waad soo jeedisay,
Aad baan u dhibaataysnahay si aanan u hadli karin. 5
Waxaan ka fikiray wakhtigii hore, Iyo sannadihii waa hore
ahaa. 6 Habeenka waxaan soo xusuustaa gabaygayga, Oo
waxaan la sheekaystaa qalbigayga, Oo ruuxaygiina aad buu
wax u doondoonay. 7 Sayidku weligiisba ma i xoorayaa? Oo
miyaanu mar dambe raalli iga ahaanaynin? 8 Naxariistiisii
miyey wada dhammaatay weligeedba? Ballankiisiina miyuu
baaqanayaa ka ab ka ab? 9 Ilaah miyuu illoobay inuu ahaado
mid raxmad badan? Naxariistiisiina ma isagoo cadhaysan
buu xidhay? (Selaah) 10 Oo weliba waxaan idhi, Tanu
waa itaaldarradayda, Laakiinse waxaan xusuusan doonaa
sannadihii gacanta midig oo Ilaaha ugu sarreeya. 11 Waxaan
ka soo sheekayn doonaa Rabbiga falimihiisa, Waayo, waxaan
soo xusuusan doonaa cajaa'ibyadaadii hore. 12 Waxaan
ka fikiri doonaa shuqulkaaga oo dhan, Oo falimahaaga
oo dhanna waan u fiirsan doonaa. 13 Ilaahow, jidkaagu
wuxuu ku dhex yaal meesha quduuska ah, Ilaahee baa sida
Ilaah u weyn? 14 Waxaad tahay Ilaah cajaa'ibyo sameeya,
Xooggaagii waxaad ogeysiisay dadyowga. 15 Gacantaadaad
dadkaagii ku soo furatay, Kuwaasoo ah ilma Yacquub iyo
Yuusuf. (Selaah) 16 Ilaahow, biyuhu way ku arkeen, Biyuhu
way ku arkeen, oo way cabsadeen, Oo moolalkuna way
gariireen. 17 Daruuruhuna biyay soo daayeen, Cirkuna
wuxuu diray dhawaaq, Oo weliba fallaadhahaaguna way
bexeen. 18 Codkii onkodkaaguna wuxuu ku dhex jiray
cirwareenta, Hillaacuna wuxuu iftiimiyey dunida, Dhulkuna
wuu gariiray oo wuu ruxmaday. 19 Jidkaaguna badduu dhex
maray, Waddooyinkaaguna waxay dhex mareen biyo badan,
Oo raadadkaagana lama aqoon. 20 Dadkaaga waxaad u hor
kacday sidii adhi oo kale, Oo waxaad iyaga ku hoggaamisay
gacanta Muuse iyo tan Haaruun.

**78** Dadkaygiiyow, sharcigayga dhegaysta, Oo dhegahana
u dhiga erayada afkayga. 2 Afkayga waxaan ku
furi doonaa masaal, Oo waxaan ku dhawaaqi doonaa
xujooyin hore, 3 Kuwaasoo aynu maqalnay oo aynu
niqiin, Oo ay awowayaasheen inoo sheegeen. 4 Ka qarin
mayno carruurtooda, Laakiin waxaynu farcanka soo socda
u sheegaynaa Rabbiga ammaantiisa, Iyo xooggiisa, iyo
shuqulladiisii yaabka badnaa oo uu sameeyey. 5 Waayo,
markhaati buu reer Yacquub ka dhex dhisay, Oo sharci
buu reer binu Israa'iil u dejiyey, Kaasoo uu ku amray
awowayaasheen, Inay carruurtooda dambe ogeysiiyaan
aawadeed, 6 Iyo in farcanka soo socdaa ay iyaga ogaadaan,
kuwaasoo ah carruurta hadda ka dib dhalanaysa, Kuwaasoo
iyana kici doona oo carruurtooda u sheegi doona, 7
Inay rajadooda Ilaah ku xidhaan, Oo aanay illoobin Ilaah
shuqulladiisii, Laakiinse ay xajiyaan amarradiisa, 8 Oo
aanay sidii awowayaashood oo kale noqon Farcan madax
adag oo caasi badan, Kaasoo ah farcan aan qalbigoodu
qummanayn, Oo naftooduna aanay xagga Ilaah aamin ku
ahayn. 9 Reer Efrayim iyagoo hub iyo qaansooyin sita Ayay
maalintii dagaalka dib u noqdeen. 10 Axdigii Ilaah ma ay
xajin, Oo waxay diideen inay sharcigiisii ku socdaan, 11
Oo waxay illoobeen falimihiisa Iyo shuqulladiisii yaabka
badnaa oo uu iyaga tusay. 12 Waxyaalo yaab badan ayuu
awowayaashood ku hor sameeyey, Markay joogeen dalkii
Masar iyo berrinkii Socan. 13 Isagu badduu kala gooyay, oo
iyagii dhex marsiiyey, Oo biyihiina wuxuu ka dhigay inay sidii
taallo u taagnaadaan. 14 Oo weliba maalinnimadii wuxuu
ku hoggaamiyey daruur, Oo habeennimadii oo dhanna
wuxuu ku hoggaamiyey dab iftiinkiis. 15 Wuxuu kala jebiyey
dhagaxyadii cidlada, Oo wuxuu iyaga ka siiyey cabniin aad
u badan oo ah sidii kan moolka laga helo. 16 Oo weliba
wuxuu dhagaxa weyn ka soo faruuray durdurro, Oo wuxuu
biyo u qulquliyey sidii webiyada oo kale. 17 Laakiinse iyagu
weli way ku sii socdeen inay isaga ku dembaabaan, Inay ku
caasiyoobaan Ilaaha ugu sarreeya intii ay cidladii joogeen.
18 Oo weliba Ilaah waxay ku tijaabiyeen qalbigooda Kolkii ay
hilib u weyddiisteen damacooda aawadiis. 19 Oo Ilaah bay
wax ka sheegeen, Oo waxay yidhaahdeen, Ilaah ma miis buu
cidlada ku diyaarin karaa? 20 Bal eeg, dhagaxii ayuu wax ku
dhuftay, markaasaa biyo ka soo buqdeen Oo durdurraa ka
soo buuxdhaafay, Haddaba miyuu kibisna bixin karaa? Miyuu
dadkiisa hilib siin karaa? 21 Sidaas daraaddeed Rabbigu
taas buu maqlay, wuuna cadhooday, Oo reer Yacquub dab
baa ku shidmay, Reer binu Israa'iilna cadhaa ku dhacday, 22
Maxaa yeelay, Ilaah ma ay rumaysan, Oo badbaadintiisana
iskuma ay hallayn. 23 Laakiin isagu wuxuu amray cirka

sare Oo albaabbadii samadana wuu furay; **24** Oo wuxuu
ku soo daayay maanna ay cunaan, Oo wuxuu iyagii wax
ka siiyey hadhuudhkii samada. **25** Dadkii waxay cuneen
kibistii malaa'igaha, Oo weliba wuxuu iyaga u soo diray
hilib ay ka dhergaan. **26** Isagu wuxuu samada ka kiciyey
dabaysha bari, Oo dabaysha koonfureedna xooggiisuu
ku hoggaamiyey. **27** Oo korkoodana hilib buu ugu soo
daadiyey sidii ciidda oo kale, Oo wuxuu ku soo daayay haad
baalal leh oo ah sidii cammuudda badaha, **28** Oo wuxuu
ku soo daadiyey xeradooda dhexdeeda, Iyo rugahooda
hareerahooda. **29** Sidaas daraaddeed iyagii way cuneen, oo
aad bay uga dhergeen, Oo isna wuxuu iyagii siiyey wixii
ay u jeellanaayeen. **30** Iyagu jeelkii damacooda kama ay
xiisa dhicin, Oo cuntadoodii weli afkooday ku jirtay, **31** Markii
cadhada Ilaah ay iyaga ku dhacday, Oo ay dishay kuwii
iyaga ugu buurbuurnaa, Oo ay laysay raggii dhallinyarada
ahaa oo reer binu Israa'iil. **32** In kastoo waxyaalahaas oo
dhammu ay ku dheceen, Weli way sii dembaabeen, Oo
mana ay rumaysan shuqulladiisii yaabka badnaa. **33** Sidaas
daraaddeed maalmahoodii wuxuu ku dhammeeyey wax aan
waxtar lahayn, Cimrigoodiina cabsi. **34** Markii uu iyaga laayay
ayay isaga dooneen, Oo haddiiba way soo noqdeen oo Ilaah
goor hore doondooneen. **35** Oo waxay xusuusteen in Ilaah
ahaa dhagaxoodii weynaa, Iyo in Ilaaha ugu sarreeyaa uu
ahaa Bixiyahooda. **36** Laakiinse waxay isaga ku faansheen
afkooda, Oo carrabkoodana been bay ugu sheegeen.
**37** Waayo, qalbigoodu xaggiisa kuma hagaagsanayn, Oo
axdigiisiina daacad uma ay ahayn. **38** Laakiinse isagoo
raxmad miidhan ah ayuu xumaantoodii cafiyey, oo mana uu
baabbi'in iyagii, Haah, oo marar badan ayuu cadhadiisii ka
leexiyey, Oo cadhadiisii oo dhanna ma uu wada kicin. **39** Oo
wuxuu xusuustay inay iyagu yihiin binu-aadmi, Iyo dabayl
iska gudubta oo aan mar dambe soo noqon. **40** Immisa jeer
bay isaga ku caasiyoobeen markay cidlada joogeen, Oo
immisa jeer bay calool xumeeyeen markay lamadegaanka
dhex joogeen! **41** Oo haddana way soo noqdeen oo
waxay tijaabiyeen Ilaah, Oo waxay ka xanaajiyeen reer
binu Israa'iil Kooda Quduuska ah. **42** Sooma ay xusuusan
gacantiisii, Iyo maalintii uu iyaga ka soo furtay cadowga
toona, **43** Iyo xataa siduu calaamooyinkiisii Masar ugu dhex
sameeyey, Yaababkiisiina berrinkii Socan. **44** Iyo siduu
webiyaashoodii dhiigga ugu beddelay, Durdurradoodiina,
si aanay waxba uga cabbi karin. **45** Wuxuu ku soo dhex
daayay duqsiyo badan, wayna cuneen, Iyo xataa rahyo,
oo iyana way baabbi'iyeen. **46** Oo weliba wixii u baxay
wuxuu siiyey diir, Oo waxay ku hawshoodeenna wuxuu
siiyey ayax. **47** Geedcanabkoodii wuxuu ku baabbi'iyey
roobdhagaxyaale, Oo dhirtoodii darayga ahaydna wuxuu
ku baabbi'iyey sayax barafoobay. **48** Xoolahoodii wuxuu ku
soo daayay roobdhagaxyaalaha, Adhyahoodiina danabyo
kulul. **49** Oo wuxuu ku soo daayay kulaylkii cadhadiisa, Iyo
xanaaq, iyo dhirif, iyo dhib, Iyo guuto ah malaa'igo shar ah.
**50** Isagu cadhadiisii wadduu u sameeyey, Oo naftoodiina
dhimasho ugama uu lexejeclaan, Laakiinse noloshoodii
wuxuu u daayay belaayada, **51** Oo wuxuu dalkii Masar ku
laayay curadyadii oo dhan, Kuwaas oo ahaa xooggoodii
u horreeyey oo uu ku dhex laayay teendhooyinkii Xaam,
**52** Laakiinse isagu dadkiisii sidii ido oo kale ayuu u hor
kacay, Oo cidladuu ku dhex hoggaamiyey iyaga sidii adhi
oo kale. **53** Oo ammaan buu ku hoggaamiyey, si aanay
u baqin, Laakiinse cadaawayaashoodii baddaa qarqisay.
**54** Oo wuxuu iyagii keenay xuduudkii meeshiisa quduuska
ah, Iyo ilaa buurtan ay midigtiisu iibsatay. **55** Oo weliba
hortoodana wuxuu ka eryay quruumaha, Oo dhaxal ahaan
buu ugu qaybiyey. Oo qabiilooyinkii reer binu Israa'iilna wuxuu
dejiyey teendhooyinkoodii. **56** Laakiin way jirrabeen oo ku
caasiyoobeen Ilaaha ugu sarreeya, Oo markhaatifurkiisiina
ma ay xajin, **57** Laakiinse dib bay u noqdeen, oo sidii
awowayaashood ayay si aan daacad ahayn ula dhaqmeen,
Oo iyagu waxay u leexdeen sidii qaanso khiyaano badan. **58**
Waayo, waxay isaga kaga xanaajiyeen meelahoodii sarsare,
Oo waxay isaga uga hinaasiyeen sanamyadooda la qoray.
**59** Ilaah markuu taas maqlay ayuu cadhooday, Oo aad
buu reer binu Israa'iil u karhay, **60** Sidaas daraaddeed
taambuuggii Shiiloh wuu dayriyey, Kaasoo ah teendhadii uu
dadka dhex dhigay, **61** Oo xooggiisii wuxuu u gacangeliyey
maxaabiisnimo, Ammaantiisiina wuxuu ku riday cadowga
gacantiisii. **62** Dadkiisiina wuxuu u gacangeliyey seef, Oo
wuxuu u cadhooday dhaxalkiisii. **63** Raggoodii dhallinyarada
ahaa dab baa laastay, Gabdhahoodiina buraanbur aroos
looma tirin. **64** Wadaaddadoodii waxay ku dhinteen seef,
Carmalladoodiina uma ay barooran. **65** Markaasaa Sayidku
wuxuu u kacay sidii mid hurdo ka toosay, Sidii nin xoog badan
oo la qaylinaya khamri daraaddiis. **66** Cadaawayaashiisiina
wuu ku dhuftay oo dib buu u celiyey, Oo wuxuu saaray
ceeb aan weligeed ka hadhayn. **67** Oo weliba wuu diiday
teendhadii reer Yuusuf, Qabiilkii reer Efrayimna ma uu
dooran, **68** Laakiinse wuxuu doortay qabiilkii reer Yahuudah,
Iyo Buur Siyoon oo uu jeclaaday. **69** Oo meeshiisii quduuska
ahayd wuxuu u dhisay sidii meelaha sare, Iyo sidii dhulka
uu weligiis adkeeyey. **70** Wuxuuna doortay addoonkiisii
Daa'uud, Oo wuxuu isaga ka soo waday xeryaha idaha,
**71** Wuxuu ka soo waday laxihii ilmo nuujinayay oo uu
raacayay, Inuu daajiyo reer Yacquub oo dadkiisa ah, iyo

reer binu Israa'iil oo dhaxalkiisa ah. 72 Haddaba wuxuu
u daajinayay si waafaqsan daacadnimada qalbigiisa, Oo
wuxuu ku hoggaaminayay farsamada gacmihiisa.

**79** Ilaahow, quruumihii kale waxay u soo galeen
dhaxalkaagii, Macbudkaagii quduuska ahaana way
nijaaseeyeen, Oo Yeruusaalemna waxay ka dhigeen
tuulmooyin. 2 Meydadkii addoommadaada waxay cunto
uga dhigeen haadka samada, Oo hilibkii quduusiintaadana
waxay cunto uga dhigeen dugaagga dhulka. 3 Dhiiggoodiina
waxay Yeruusaalem hareeraheeda ugu daadiyeen sidii biyo
oo kale, Cid aastaana ma jirin. 4 Waxaannu cay u noqonnay
derisyadayadii, Kuwa nagu wareegsanna wax la quudhsado
oo lagu qoslo. 5 Rabbiyow, ilaa goormaad noo cadhaysnaan
doontaa? Ma weligaa baa? Masayrkaagu ma sida dab buu
u ololi doonaa? 6 Cadhadaada ku soo deji quruumaha
aan ku aqoon, Iyo boqortooyooyinka aan magacaaga
kugu baryin. 7 Waayo, waxay laayeen reer Yacquub,
Rugtoodiina way baabbi'iyeen. 8 Ha noo xusuusnaan
dembiyadii awowayaashayo, Naxariistaadu dhaqsiyo ha
noogu timaado, Waayo, aad baa lanoo dhibay. 9 Ilaaha
badbaadadayadow, magacaaga ammaantiisa daraaddeed
noo caawi, Oo magacaaga daraaddiis noo samatabbixi, oo
dembiyadayada naga nadiifi. 10 Bal maxaa quruumuhu u
leeyihiin, Ilaahoodu meeh? Dhiiggii addoommadaada oo ay
daadiyeen aargoosashadiisii Ha lagu ogaado quruumaha
dhexdooda annagoo arkayna. 11 Maxbuuska taahiisu
hortaada ha yimaado, Xooggaaga weynaantiisa ku badbaadi
kuwa dhimashada lagu xukumay. 12 Sayidow, derisyadayada
toddoba jibbaar ugu abaalmari, Oo laabta u geli caydii ay
kugu caayeen. 13 Haddaba annagoo ah dadkaaga iyo idihii
daaqsintaada Waannu kugu mahadnaqaynaa weligayo, Oo
ammaantaada waannu ka sheekaysan doonnaa tan iyo ka
ab ka ab.

**80** Na maqal, Adhijirka reer binu Israa'iil jirow, Kaaga reer
Yuusuf sida adhi u hor kacow, Kaaga Keruubiimta ku
dul fadhiyow, soo iftiin. 2 Reer Efrayim iyo reer Benyaamiin
iyo reer Manaseh hortooda xooggaaga ku kici, Oo kaalay oo
na badbaadi. 3 Ilaahow, mar kale na soo celi, Oo wejigaaga
noo iftiimi, oo waannu badbaadi doonnaa. 4 Rabbiyow
Ilaaha ciidammadow, Ilaa goormaad u cadhaysnaan doontaa
baryootanka dadkaaga? 5 Waxaad ku quudisay kibistii
ilmada, Oo ilmo aad u badanna ayaad cabsiisay. 6 Waxaad
nala dirirsiisay derisyadayada, Oo cadaawayaashayadiina
way nagu qoslaan. 7 Ilaaha ciidammadow, mar kale na
soo celi, Oo wejigaaga noo iftiimi, oo waannu badbaadi
doonnaa. 8 Geed canab ah ayaad dalkii Masar ka keentay,
Oo intaad quruumihii ka eriday ayaad meel ku beertay. 9
Meel baad hortiisa ku diyaarisay, Oo wuxuu yeeshay xididdo
dhaadheer, kolkaasuu dhulkii buuxiyey. 10 Oo buurihii waxaa
qariyey hooskiisii, Oo laamihiisiina waxay noqdeen sidii
geedaha la yidhaahdo kedar oo Ilaah. 11 Laamihiisii wuxuu
gaadhsiiyey tan iyo badda, Dhudihiisiina waxay gaadheen
tan iyo Webiga. 12 Bal maxaad deyrkiisii u dumisay Si
ay kuwa jidka maraa oo dhammu u goostaan? 13 Waxaa
kharriba doofaarka kaynta, Oo waxaa iska daaqda ugaadha
duurka. 14 Ilaaha ciidammadow, waannu ku baryaynaaye
noo soo noqo, Samada hoos nooga soo fiiri oo intaad soo
eegtid, geedkan canabka ah soo booqo, 15 Oo ilaali wixii ay
gacantaada midig beertay, Iyo laantii aad adkaysatay. 16 Dab
baa lagu gubay, oo waa la gooyay, Oo waxay ku halligmeen
canaantii jaahaaga. 17 Gacantaadu ha kor saarnaato ninka
gacantaada midig jooga, Iyo binu-aadmigii aad nafsaddaada
u xoogaysatay. 18 Markaas dib kaaga noqon mayno, Na
noolee, oo markaasaannu magacaaga ku baryootamaynaa.
19 Rabbiyow Ilaaha ciidammadow, mar kale na soo celi, Oo
wejigaaga noo iftiimi, oo waannu badbaadi doonnaa.

**81** Aad ugu gabya Ilaaha xooggeenna ah, Oo farxad ugu
qayliya Ilaaha Yacquub. 2 Sabuurka kor u qaada, oo
waxaad halkan keentaan dafka, Iyo kataaradda lagu farxo,
iyo shareeradda. 3 Buunka afuufa markay bishu dhalato, Iyo
markuu dayaxu caddo buuxda yahay, iyo maalinta iiddeenna
quduuska ah. 4 Waayo, taasu qaynuun bay u tahay reer
binu Israa'iil, Waana amar ka yimid Ilaaha Yacquub. 5 Oo
wuxuu reer Yuusuf dhexdooda ka dhigay markhaati, Markii
uu dalkii Masar ku soo baxay, Halkaas oo aan ka maqlay
af aanan aqoon. 6 Garbihiisa waxaan ka qaaday culaabtii
saarnayd, Gacmihiisana waxaa laga xoreeyey dambiishii.
7 Waad ii dhawaaqatay markii dhib kuu yimid, oo anna
waan ku soo samatabbixiyey, Waxaan kaaga jawaabay
onkodka meeshiisa qarsoon, Oo waxaan kugu tijaabiyey
biyihii Meriibaah. (Selaah) 8 Dadkaygiiyow, bal i maqla,
Oo anna waan idiin digi doonaa, Reer binu Israa'iilow, bal
haddaad i maqli lahaydeen! 9 Waa inaan ilaah qalaad
idinku dhex jirin, Oo waa inaydaan innaba ilaah qalaad
caabudin. 10 Anigu waxaan ahay Rabbiga Ilaahaaga ah, Oo
kaa soo bixiyey dalkii Masar, Afkaaga aad u kala qaad, oo
anna waan buuxin doonaa. 11 Laakiinse dadkaygii ma ay
dhegaysan codkaygii, Oo reer binu Israa'iilna ima aqbalin.
12 Sidaas daraaddeed waxaan u daayay inay ku socdaan
madaxadayggooda. Si ay taladooda ugu socdaan. 13 Bal
may dadkaygu i dhegaystaan, Oo reer binu Israa'iil bal
may jidkayga ku socdaan! 14 Oo waxaan haddiiba jebin

lahaa cadaawayaashooda, Oo gacantaydana waan ku jeedin lahaa colkooda. **15** Kuwa Rabbiga necebu waxay hoos geli lahaayeen isaga, Laakiinse wakhtigoodu weligiis wuu waari lahaa. **16** Oo weliba wuxuu iyaga ku quudin lahaa sarreenka ugu wanaagsan, Oo waxaan ka dhergin lahaa malabka dhagaxa ka soo baxa.

**82** Ilaah wuxuu dhex istaagaa ururka Ilaah, Oo wuxuu wax ku xukumaa ilaahyada dhexdooda, **2** Ilaa goormaad xaqdarro wax ku xukumaysaan? Oo ilaa goormaad kuwa sharka leh u eexanaysaan? (Selaah) **3** Miskiinka iyo agoonka gar siiya, Oo caddaalad ugu garsoora kan dhibaataysan iyo saboolka. **4** Badbaadiya miskiinka iyo kan baahan, Oo ka samatabbixiya gacanta kuwa sharka leh. **5** Iyagu waxba ma yaqaaniin, waxna garan maayaan, Oo gudcur bay hor iyo dib ugu socdaan, Dhulka aasaaskiisii oo dhammu waa wada dhaqdhaqaaqay. **6** Waxaan idhi, Idinku waxaad tihiin ilaahyo, Oo dhammaantiin waxaad tihiin Ilaaha uga sarreeya wiilashiisii. **7** Habase yeeshee waxaad u dhiman doontaan sida dadka oo kale, Oo waxaad u dhici doontaan sida amiirrada midkood. **8** Ilaahow, sara joogso oo dhulka xukun, Waayo, waxaad dhaxli doontaa quruumaha oo dhan.

**83** Ilaahow, shib ha odhan, Oo ha aamusin, afkana ha haysan, Ilaahow. **2** Waayo, bal eeg, cadaawayaashaadu way buuqaan, Oo kuwii ku nebcaana madaxay kor u qaadeen. **3** Dadkaagay xeelad ugu tashadaan, Oo waxay dhammaantood u arrinsadaan kuwaad qarisay. **4** Waxay isku yidhaahdeen, Kaalaya, aan baabbi'innee, yaanay mar dambe quruun ahaanine. Si aan magaca Israa'iil dib loogu soo xusuusan. **5** Waayo, iyagoo isku waafaqsan ayay ku arrinsadeen, Oo axdi kaa gees ah ayay isla dhigtaan, **6** Teendhooyinkii reer Edom iyo reer Ismaaciil, Iyo reer Moo'aab iyo reer Hagariim, **7** Reer Gebal iyo reer Cammoon iyo reer Camaaleq, Reer Falastiin iyo kuwii Turos degganaa, **8** Oo xataa reer Ashuurna way ku darsameen, Oo waxay kaalmeeyeen ilma Luud. (Selaah) **9** Iyaga ku samee wixii aad ku samaysay reer Midyaan, Iyo Siiseraa iyo Yaabiin markii ay ag joogeen Webi Qiishoon, **10** Waxay ku halligmeen Ceyn Door, Oo waxay dhulka u noqdeen digo. **11** Nimankooda gobta ah oo dhan waxaad ka dhigtaa sida Cooreeb iyo Se'eeb, Oo amiirradooda oo dhanna sida Sebah iyo Salmunnac, **12** Kuwaas oo isyidhi, War aan iska qaadanno oo hantinno Ilaah degmooyinkiisa. **13** Ilaahayow, iyaga ka dhig sida boodhka warwareega, Iyo sida xaab dabaysha ka horreeya, **14** Sida dabka duurka guba, Iyo sida ololka buuraha huriya, **15** Sidaasoo kale iyaga duufaankaaga ku eri, Hufadaadana ku cabsii. **16** Rabbiyow, wejigoodu wareer ha ka buuxsamo, Si ay magacaaga u doondoonaan. **17** Weligood ha ceeboobeen, hana baqeen, Ha wareereen, hana baabbe'een, **18** Si ay u ogaadaan in adigoo magacaagu Ilaah yahay Aad tahay Ilaaha ugu sarreeya dunida oo dhan.

**84** Rabbiga ciidammadow, taambuugyadaadu sidee bay u yihiin wax la jeclaado! **2** Naftaydu waxay u xiisaysan tahay Rabbiga barxadihiisa, Qalbigayga iyo jiidhkayguba waxay u dhawaaqaan Ilaaha nool. **3** Haah, shimbirtu waxay nafsaddeeda u heshay guri, Dabafallaadhuna buul ay yaryarkeeda ku dhasho, Kaas oo ah meelaha allabarigaaga, Rabbiga ciidammadow, Boqorkaygiiyow, Ilaahaygiiyow. **4** Waxaa barakaysan kuwa gurigaaga deggan, Weligoodba way ku sii ammaani doonaan. **5** Waxaa barakaysan ninkii xooggiisu xaggaaga ka yimaado, Oo ay jidadka sare oo Siyoon qalbigiisa ku jiraan. **6** Markay dhex maraan Dooxadii Oohinta waxay ka dhigaan meel ilo badan leh, Haah, oo roobka hore ayaa barakooyin ka buuxiya. **7** Way xoogaystaan, oo weliba way sii xoogaystaan, Oo midkood kastaaba Ilaah buu ka hor muuqdaa Siyoon dhexdeeda. **8** Rabbiyow, Ilaaha ciidammadow, baryadayda maqal, Ilaaha Yacquubow, bal dhegta ii dhig, (Selaah) **9** Ilaahow, gaashaankayagiiyow, bal eeg, Oo bal kaaga la subkay wejigiisa fiiri. **10** Waayo, maalin barxadahaaga la joogo way ka sii wanaagsan tahay kun maalmood oo kale. Intaan teendhooyinka sharka joogi lahaa, Waxaan ka sii jeclaan lahaa inaan guriga Ilaah iridjooge u ahaado. **11** Waayo, Rabbiga Ilaaha ahu waxa weeye qorrax iyo gaashaan, Rabbigu wax wanaagsan kalama hadhi doono kuwa si qumman u socda. Wuxuuna siin doonaa naxariis iyo sharaf. **12** Rabbiga ciidammadow, Waxaa barakaysan ninkii isku kaa halleeya.

**85** Rabbiyow, dalkaagii waad u roonaatay, Oo waxaad soo celisay maxaabiistii reer Yacquub. **2** Xumaantii dadkaagana waad cafiday, Oo dembigoodii oo dhanna waad qarisay. (Selaah) **3** Cadhadaadii oo dhan waad fogaysay, Oo waad ka soo noqotay kulaylkii xanaaqaaga. **4** Ilaaha Badbaadadayadow, na soo celi, Oo dhirifkaaga naga jooji. **5** Miyaad weligaaba noo cadhaysnaanaysaa? Oo xanaaqaaga miyaad sii dheeraynaysaa tan iyo ka ab ka ab? **6** Miyaanad mar dambe na soo noolaynayn, Si ay dadkaagu kuugu reyreeyaan? **7** Rabbiyow, naxariistaada na tus, Oo badbaadadaada na sii. **8** Waan maqli doonaa waxa Ilaaha Rabbiga ahu ku hadlo, Waayo, nabad buu kula hadli doonaa dadkiisa iyo quduusiintiisa, Laakiin yaanay nacasnimo ku noqon. **9** Hubaal badbaadadiisu way u dhow dahay kuwa isaga ka cabsada, Si ay ammaanu dalkayaga u degganaato. **10** Naxariis iyo runu way isla kulmeen,

Xaqnimo iyo nabaduna way isdhunkadeen. 11 Runtu waxay
ka soo baxdaa dhulka, Xaqnimaduna waxay hoos ka soo
fiirisaa samada. 12 Haah, Rabbigu wuxuu ina siin doonaa
waxa wanaagsan, Oo dalkeennuna wuxuu soo bixin doonaa
midhihiisa. 13 Hortiisa waxaa socon doonta xaqnimo, Oo
waxay tallaabooyinkiisa ka dhigi doontaa jid la maro.

**86** Rabbiyow, dhegtaada ii soo dhig, oo ii jawaab, Waayo,
waxaan ahay miskiin iyo mid baahane. 2 Naftayda
dhawr, waayo, waxaan ahay mid cibaado leh, Ilaahayow,
i badbaadi anigoo ah addoonkaaga isku kaa halleeya. 3
Sayidow, ii naxariiso, Waayo, maalinta oo dhan adaan
kuu qayshadaa. 4 Sayidow, addoonkaaga naftiisa ka farxi,
Waayo, naftayda adigaan kor kuugu soo qaadaa. 5 Waayo,
Sayidow, waad wanaagsan tahay, oo waxaad diyaar u
tahay inaad dembidhaafto, Waanad u naxariis badan tahay
kuwa ku barya oo dhan. 6 Rabbiyow, baryadayda dhegta
u dhig, Oo codka baryootankayga maqal. 7 Maalinta aan
dhibaataysnahay adaan ku baryi doonaa, Waayo, waad ii
jawaabi doontaa. 8 Sayidow, adigoo kale ilaahyada kuma jiro,
Oo shuqulladaadana wax la mid ahu ma jiraan. 9 Sayidow,
quruumihii aad samaysay oo dhammu way iman doonaan oo
hortaaday ku sujuudi doonaan, Waxay ammaani doonaan
magacaaga. 10 Waayo, adigu waad weyn tahay, oo waxyaalo
yaab badanna waad samaysaa, Oo adiga keliya ayaa Ilaah
ah. 11 Rabbiyow, jidkaaga i bar, oo anna runtaadaan ku
socon doonaa, Qalbigayga mid ka dhig si aan magacaaga
uga cabsado. 12 Sayidow Ilaahayow, qalbigayga oo dhan
waan kugu ammaanayaa, Oo weligayba waxaan ammaani
doonaa magacaaga. 13 Waayo, naxariistaadu xaggayga way
ku weyn tahay, Naftaydana waxaad ka soo samatabbixisay
She'oolka ugu hooseeya. **(Sheol h7585)** 14 Ilaahow, kuwa
kibirka lahu way igu keceen, Ururka dadka dulmiga badanna
waxay doonayeen inay nafta iga qaadaan, Oo adigana
kuuma ay soo jeesan. 15 Laakiinse adigu Sayidow, waxaad
tahay Ilaah ay raxmad iyo nimco ka buuxaan, Oo cadhada u
gaabiya, oo naxariis iyo runba badan. 16 Ii soo jeeso, oo ii
naxariiso, Oo anoo addoonkaaga ah xoog i sii, Oo i badbaadi
anoo wiilka addoontaada ah. 17 Calaamad wanaaggaaga
lagu garto i tus, Si ay kuwa i necebu u arkaan, oo ay u
ceeboobaan, Maxaa yeelay, Rabbiyow, waad i caawisay, oo
waad i qalbi qaboojisay.

**87** Aasaaskiisu wuxuu ku jiraa buuraha quduuska ah. 2
Rabbigu degmooyinka reer Yacquub oo dhan Wuxuu ka
jecel yahay irdaha Siyoon. 3 Magaalada Ilaahay, Waxyaalo
ammaan badan ayaa lagaa sheegaa. (Selaah) 4 Anigu
waxaan ka sheekayn doonaa Rahab iyo Baabuloon sidii
kuwo i yaqaan, Bal eeg, Falastiin, iyo Turos, iyo Itoobiya.
Midkanu halkaasuu ku dhashay. 5 Haah, oo Siyoonna waxaa
laga odhan doonaa, Midkan iyo midkaasuba iyaduu ku
dhashay, Oo Ilaaha ugu sarreeya ayaa iyada dhisi doona. 6
Rabbigu wuu tirin doonaa markuu dadka qorayo, Midkanu
halkaasuu ku dhashay. (Selaah) 7 Kuwa gabya iyo kuwa
cayaaraaba waxay odhan doonaan, Waxaa kugu jira ilahayga
oo dhan.

**88** Rabbiyow, Ilaaha badbaadadaydow, Habeen iyo
maalinba hortaadaan ka qayliyey, 2 Baryootankaygu
hortaada ha yimaado, Oo qayladayda dhegta u dhig, 3 Waayo,
naftayda waxaa ka buuxa dhibaatooyin, Oo noloshayduna
waxay ku dhowaanaysaa She'ool. **(Sheol h7585)** 4 Waxaa laygu
tiiriyey kuwa hoos ugu dhaadhaca yamayska, Oo waxaan
ahay sida nin aan xoog lahayn, 5 Oo meydadka lagu dhex
tuuray, Sida kuwa la laayay oo xabaalaha yaal, Oo aanad mar
dambe soo xusuusnayn, Kuwaas oo ah kuwa gacantaada ka
go'ay. 6 Waxaad igu ridday yamayska ugu hooseeya, Iyo
gudcurka, iyo meelaha dhaadheer. 7 Cadhadaadii baa igu
soo degtay, Oo waxaad igu dhibtay hirarkaagii oo dhan.
(Selaah) 8 Kuwii aan iqiin waad iga fogaysay, Oo karaahiyaad
iga dhigtay xaggooda. Waa lay xidhay, oo sooma aan
bixi karo. 9 Indhahaygu waxay la gudheen dhibaatada
daraaddeed, Rabbiyow, maalin kasta waan kuu yeedhay,
Oo gacmahaygana adigaan kuu hoorsaday. 10 Ma yaabab
baad tusaysaa meydadka? Kuwii dhintay miyey soo sara
kacayaan oo ku ammaanayaan? (Selaah) 11 Raxmaddaada
miyaa qabriga lagu sheegayaa? Aaminnimadaadana miyaa
halligaadda laga dhex sheegayaa? 12 Yaababkaaga miyaa
gudcurka lagu ogaanayaa? Xaqnimadaadana ma waxaa
lagu ogaanayaa dalka illoobidda? 13 Laakiinse Rabbiyow,
adigaan kuu qayshaday, Oo baryootankayguna subaxduu
hortaada imanayaa. 14 Rabbiyow, bal maxaad naftayda u
xooraysaa? Oo bal maxaad wejigaaga iiga qarinaysaa? 15
Waan dhibaataysnaa oo waxaan ku dhowaa inaan dhinto
tan iyo yaraantaydiiba, Intaad cabsidaada igu riddayna waan
caataysnaa. 16 Cadhadaadii kululayd ayaa i kor martay, Oo
waxaa i baabbi'iyey waxyaalihii aad igu cabsiisay. 17 Maalintii
oo dhan waxay hareerahayga ugu wareegsanaayeen sidii
biyo oo kale, Dhammaantood way i wada hareereeyeen. 18
Kii i jeclaa iyo saaxiibkayba waad iga fogaysay, Oo kuwii
aan iqiinna gudcur baad iga gelisay.

**89** Anigu weligayba waxaan ku gabyi doonaa Rabbiga
waxyaalihiisa naxariista leh, Oo aaminnimadaadana
afkaygaan ka ab ka ab ku ogeysiinayaa. 2 Waayo, waxaan
idhi, Naxariistu weligeedba way dhisnaan doontaa, Oo

aaminnimadaadana waxaad ku adkayn doontaa samooyinka
qudhooda. **3** Axdi baan la dhigtay kii aan doortay, Oo
waxaan u dhaartay addoonkaygii Daa'uud, oo ku idhi,
**4** Farcankaaga weligayba waan sii adkayn doonaa, Oo
carshigaaguna wuu dhisnaan doonaa tan iyo ka ab ka ab.
(Selaah) **5** Rabbiyow, samooyinku waxay ammaani doonaan
yaababkaaga, Oo weliba aaminnimadaadana waxaa laga
dhex sheegi doonaa shirka kuwa quduuska ah. **6** Waayo,
bal yaa cirka ku jira oo Rabbiga lala simi karaa? Bal yaase
ku dhex jira wiilasha kuwa xoogga badan oo Rabbiga la mid
ah, **7** Kaas oo ah Ilaaha ugu cabsida badan guddiga kuwa
quduuska ah, Oo waajibka tahay in kuwa hareerihiisa ku
wareegsan oo dhammu ay ka cabsadaan. **8** Rabbiyow Ilaaha
ciidammadow, Bal yaa sidaada u xoog badan, Rabbiyow?
Aaminnimadaadu hareerahaagay ku wareegsan tahay. **9**
Adigaa u taliya badda kibirkeeda, Oo markii hirarkeedu
kacaan adigaa dejiya. **10** Rahab waxaad u kala burburisay
sidii mid la dilay, Oo cadaawayaashaadiina waxaad ku
kala firdhisay gacanta xooggaaga. **11** Samooyinka adigaa
iska leh, dhulkana adigaa iska leh, Dunida iyo waxaa
ka buuxana adigaa aasaasay. **12** Woqooyi iyo koonfurba
adigaa abuuray, Taaboor iyo Xermoonba magacaagay ku
reyreeyaan. **13** Adigu waxaad leedahay dhudhun itaal weyn,
Gacantaaduna way xoog badan tahay, midigtaaduna way
sarraysaa. **14** Carshigaaga aasaaskiisu waxa weeye xaq iyo
caddaalad, Oo naxariista iyo runtuna way ku hor socdaan.
**15** Waxaa barakaysan dadka yaqaan dhawaaqa farxadda
leh, Rabbiyow, waxay ku socdaan wejigaaga iftiinkiisa,
**16** Maalinta oo dhan waxay ku reyreeyaan magacaaga,
Oo waxay ku sara marayaan xaqnimadaada. **17** Waayo,
waxaad tahay ammaantii xooggooda, Oo raallinimadaada
daraaddeed ayaa geeskayaga kor loogu sarraysiin doonaa.
**18** Waayo, gaashaankayaga waxaa iska leh Rabbiga, Oo
boqorkayagana waxaa iska leh Kan quduuska ah oo reer binu
Israa'iil. **19** Markaas quduusiintaada waxaad kula hadashay
muuqasho, Oo waxaad ku tidhi, Waxaan caawimaad kor
saaray mid xoog badan, Oo waxaan sarraysiiyey mid dadka
laga doortay. **20** Waxaan helay addoonkaygii Daa'uud ahaa,
Oo waxaan ku subkay saliiddaydii quduuska ahayd, **21** Oo
gacantaydu isagay la jiri doontaa, Dhudhunkayguna isaguu
xoogayn doonaa. **22** Cadowgu ma dulmi doono, Wiilka
sharnimaduna ma dhibi doono. **23** Oo cadaawayaashiisa
hortiisaan ku wada burburin doonaa, Oo kuwa isaga
necebna waan layn doonaa. **24** Laakiinse aaminnimadayda
iyo naxariistaydu isagay la jiri doonaan, Oo geeskiisana
waxaa lagu sarraysiin doonaa magacayga. **25** Oo weliba
gacantiisa waxaan ka sarraysiin doonaa badda, Midigtiisana
webiyaasha. **26** Aniguu ii qayshan doonaa, oo wuxuu odhan
doonaa, Adigu waxaad tahay aabbahay, Iyo Ilaahay, iyo
dhagaxii weynaa oo badbaadadayda. **27** Oo weliba waxaan
isaga ka dhigi doonaa curadkayga, Oo wuxuu ahaan doonaa
boqorrada dunida kan ugu wada sarreeya. **28** Weligayba
waxaan isaga u hayn doonaa naxariistayda, Oo axdigayguna
isaguu ku sii adkaan doona. **29** Oo weliba farcankiisana
waxaan ka dhigi doonaa mid weligiis waara, Carshigiisana
sida wakhtiga samada. **30** Carruurtiisu hadday sharcigayga
ka tagaan, Oo aanay ku socon xukummadayda, **31** Hadday
qaynuunnadayda jebiyaan, Oo aanay amarradayda dhawrin,
**32** Markaas xadgudubkooda waxaan kaga abaalmarin doonaa
ul, Xumaantoodana jeedal. **33** Laakiinse naxariistayda oo
dhan kama wada qaadi doono, Aaminnimadayduna inay
isaga gabto uma oggolaan doono. **34** Axdigayga ma jebin
doono, Oo wixii afkayga ka soo baxayna ma beddeli doono.
**35** Mar baan waxaan ku dhaartay quduusnimadayda, Oo
Daa'uud been uma sheegi doono, **36** Farcankiisu weligiisuu
waari doonaa, Carshigiisuna wuxuu u waari doonaa sida
qorraxda hortayda ka ifaysa. **37** Oo wuxuu weligiisba u sii jiri
doonaa sida dayaxa, Iyo sida markhaatiga daacadda ah oo
cirka jooga. (Selaah) **38** Laakiinse adigu waad xoortay oo
waad nacday, Oo waxaad u cadhootay kaaga subkan. **39**
Axdigii addoonkaaga waad nacday, Oo taajkiisiina waad
nijaasaysay oo dhulka ku tuurtay. **40** Deyrarkiisii oo dhan
waad dumisay, Oo qalcadihiisii oo dhanna waad burburisay.
**41** Wax alla wixii jidka soo mara oo dhanba isagay dhacaan,
Oo derisyadiisana wuxuu u noqday cay. **42** Waxaad kor
u qaadday midigtii kuwii dulmayay, Cadaawayaashiisii oo
dhanna waad ka farxisay. **43** Oo weliba afka seeftiisana dib
baad u celisaa, Isagiina kama aad dhigin inuu dagaalka
ku sii adkaysto. **44** Iftiinkiisii waad demisay, Carshigiisiina
dhulkaad ku tuurtay. **45** Cimrigii dhallinyaranimadiisii waad
soo gaabisay, Oo waxaad isagii ka muujisay ceeb. (Selaah)
**46** Rabbiyow, ilaa goormaad isqarin doontaa? Ma weligaa
baa? Oo ilaa goormay cadhadaadu sida dab u ololi doontaa?
**47** Bal xusuuso sida wakhtigaygu u gaaban yahay, Waayo,
sidaad binu-aadmiga oo dhan u abuurtay micnedarnaa! **48**
Bal waa ninkee kan iska noolaan doona isagoo aan dhimasho
arkin, Oo naftiisa ka samatabbixin doona xoogga She'ool?
(Selaah) **(Sheol h7585)** **49** Sayidow, meeday naxariistaadii
hore, Oo aad Daa'uud aaminnimadaada ugu dhaaratay?
**50** Sayidow, bal soo xusuuso cayda addoommadaada, Iyo
sida aan laabta ugu sido cayda dadka badan oo dhan, **51**
Rabbiyow, waana tii ay cadaawayaashaadu igu caayeen,
Oo waa tii ay ku caayeen tallaabooyinka kaaga subkan. **52**

Mahad waxaa leh Rabbiga tan iyo weligiisba. Aamiin, iyo aamiin.

**90** Rabbiyow, tan iyo ka ab ka ab Adigu waxaad noo ahayd meesha aannu degganaanno. **2** Intaan buuruhu dhalan ka hor, Iyo intaanad samayn dhulka iyo dunida, Iyo xataa weligeed iyo weligeedba adigu waxaad tahay Ilaah. **3** Dadka waxaad ku soo celisaa baabba', Oo waxaad ku tidhaahdaa, Noqda, binu-aadmigow. **4** Waayo, kun sannadood waxay hortaada ku yihiin Sida shalay oo kale markay dhammaadaan. Oo waxay la mid yihiin sida wakhti la soo jeedo oo habeennimo. **5** Waxaad iyaga u qaaddaa sida daadku wax u qaado, oo iyagu waxa weeye sida hurdo oo kale, Oo subaxdana waxay u baxaan sida doog oo kale. **6** Subaxda way cagaaraan, wayna soo baxaan, Oo fiidkana waa la jaraa, wayna engegaan. **7** Waayo, annagu cadhadaadii baannu ku baabba'nay, Oo waxaan ku dhibtoonnay xanaaqaagii. **8** Xumaatooyinkayagii waxaad dhigtay hortaada, Oo dembiyadayadii qarsoonaana waxaad dhigtay iftiinka wejigaaga. **9** Waayo, maalmahayagii oo dhammu waxay nagu dhaafeen cadhadaada, Oo cimrigayagiina wuxuu u dhammaaday sidii sheeko la sheegay. **10** Waayo, wakhtiga cimrigayagu waxa weeye toddobaatan sannadood, Oo xataa hadduu xoog aawadiis ku sii dheeraado waa siddeetan sannadood, Laakiinse faankiisu waa hawl iyo caloolxumo miidhan, Waayo, haddiiba wuu iska dhammaadaa, oo annana waannu duulnaa. **11** Bal yaa yaqaan cadhadaada xooggeeda, Iyo xanaaqaaga kaas oo waafaqsan cabsida kugu habboon in lagaa cabsado? **12** Haddaba na bar inaannu tirinno maalmaha cimrigayaga, Si aannu u helno qalbi xigmad leh. **13** Rabbiyow, soo noqo, ilaa goormaad soo noqonaysaa? Oo raalli ka ahow addoommadaada. **14** Aroorta naxariistaada naga dhergi, Si aannu u rayrayno oo aannu u faraxsanaano maalmaha cimrigayaga oo dhan. **15** Nooga farxi intii ay ahaayeen maalmihii aad na dhibtay, Iyo sannadihii aan sharka aragnay in le'eg. **16** Shuqulkaagu ha u muuqdo addoommadaada, Ammaantaaduna carruurtooda. **17** Oo Rabbiga Ilaahayaga ah nicmadiisu ha na dul joogto, Oo korkayaga ku adkee shuqulka gacmahayaga, Haah, shuqulka gacmahayaga adkee.

**91** Kan dega Ilaaha ugu sarreeya meeshiisa qarsoon Wuxuu joogi doonaa hooska Qaadirka. **2** Waxaan Rabbiga ka odhan doonaa, Isagu waa magangalkayga iyo qalcaddayda Oo waa Ilaahayga aan isku halleeyo. **3** Waayo, wuxuu kaa samatabbixin doonaa dabinka ugaadhsadaha, Iyo belaayada aad u xun. **4** Oo wuxuu kugu dedi doonaa baalashiisa, Oo waxaad magangeli doontaa baadadkiisa, Runtiisuna waxay tahay gaashaan iyo gabbaad. **5** Waa inaanad ka cabsan naxdinta habeennimada, Iyo fallaadha dharaarnimada duulaysa toona, **6** Ama belaayada gudcurka ku socota, Iyo halligaadda duhurka wax baabbi'isa. **7** Dhinacaaga waxaa ku dhici doona kun, Midigtaadana waxaa ku ag dhici doona toban kun, Innabase kuuma soo dhowaan doonto. **8** Laakiinse indhaha uun baad ku fiirin doontaa, Oo waxaad arki doontaa kuwa sharka leh abaalgudkooda. **9** Waayo, waxaad tidhi, Rabbigu waa magangalkayga, Oo Kan ugu sarreeya ayaa degmadayda ah. **10** Shar kuguma dhici doono, Belaayona teendhadaada uma soo dhowaan doonto. **11** Waayo, isagu wuxuu malaa'igihiisa ku amri doonaa Inay jidadkaaga oo dhan kugu ilaaliyaan. **12** Oo iyaguna gacmahooday sare kuugu qaban doonaan Inaanay cagtaadu dhagax ku dhicin. **13** Libaaxa iyo jilbiska ayaad ku joogsan doontaa, Oo waxaad ku tuman doontaa aaran libaax iyo abeesada. **14** Rabbigu wuxuu yidhi, Isagu aad buu ii jeclaaday, oo sidaas daraaddeed ayaan u samatabbixin doonaa, Meel sare ayaan ku fadhiisin doonaa, maxaa yeelay, magacayguu yiqiin. **15** Wuu i baryi doonaa, oo waan u jawaabi doonaa, Oo markuu dhibaataysan yahay, waan la jiri doonaa, Oo waan samatabbixin doonaa, waanan murwayn doonaa. **16** Cimri dheer ayaan ka dhergin doonaa, Oo waxaan tusi doonaa badbaadintayda.

**92** Waa wanaagsan tahay in Rabbiga lagu mahadnaqo, Iyo in magacaaga ammaan loogu gabyo, Ilaaha ugu sarreeyow, **2** Iyo in raxmaddaada aroorta la muujiyo, Habeen kastana aaminnimadaada, **3** Iyo in loogu heeso alaabta muusikada oo tobanka xadhig leh, iyo shareeradda, Iyo dhawaaqa kataaradda. **4** Waayo, Rabbiyow, waxaad igaga farxisay shuqulkaagii, Oo shuqullada gacmahaagana waan ku guulaysan doonaa. **5** Rabbiyow, shuqulladaadu waaweynaa! Oo fikirradaaduna aad bay u mool dheer yihiin. **6** Doqonku taas ma yaqaan, Kii nacas ahuna ma garan karo. **7** Kuwa sharka lahu markii ay sida doog u soo baxaan, Iyo markii xumaanfalayaasha oo dhammu ay barwaaqoobaan, Waa in weligoodba la baabbi'iyo, **8** Laakiinse Rabbiyow, adigu waad sarraysaa weligaa iyo weligaaba. **9** Waayo, Rabbiyow, bal eeg cadaawayaashaada, Bal eeg, cadaawayaashaadu way wada baabbi'i doonaane, Oo xumaanfalayaasha oo dhammuna way kala firidhsanaan doonaan. **10** Laakiinse geeskayga waxaad u sarraysiisay sida geeska gisiga Oo waxaa laygu subkay saliid cusub. **11** Indhahayguna waxay arkeen wixii aan cadaawayaashayda la jeclaa, Oo dhegahayguna waxay maqleen wixii aan la

jeclaa sharfalayaasha igu kaca. 12 Kii xaq ahu wuxuu u
barwaaqoobi doonaa sida geed timireed, Oo wuxuu u bixi
doonaa sida geed kedar la yidhaahdo oo Lubnaan. 13 Kuwa
guriga Rabbiga lagu dhex beeray Waxay ku barwaaqoobi
doonaan barxadaha Ilaahayaga. 14 Oo weliba midho bay
dhali doonaan iyagoo gaboobay, Oo waxaa ka buuxi doona
muud, wayna cagaari doonaan, 15 Si ay u muujiyaan in
Rabbigu qumman yahay, Isagu waa dhagaxayga gabbaadka
ah, oo xaqdarro kuma jirto.

**93** Rabbigaa taliya, oo wuxuu huwan yahay haybad,
Rabbigu waa huwan yahay, oo wuxuu dhexda ku
xidhay xoog, Duniduna waxay u dhisan tahay si aan la
dhaqaajin karin. 2 Carshigaagu wuxuu dhismay waa hore, Oo
adiguna waxaad jirtay tan iyo weligaa. 3 Rabbiyow, webiyadii
kor bay u kaceen, Webiyadii codkooday kor u qaadeen, Oo
webiyadii waxay kor u qaadeen hirarkoodii. 4 Biyaha badan
codkooda, Iyo mawjadaha badda oo waaweynba Waxaa ka
sii xoog badan Rabbiga sare. 5 Rabbiyow, markhaatifurkaagu
waa hubaal, Oo weligaaba waxaa gurigaaga ku habboon
quduusnimo.

**94** Rabbiyow, Ilaaha aargudashada lahow, Ilaaha
aargudashada lahow, soo iftiin. 2 Xaakinka dunidow,
sara joogso, Oo kuwa kibray abaalkooda mari. 3 Rabbiyow,
kuwa sharka lahu ilaa goormay, Kuwa sharka lahu ilaa
goormay guulaysanayaan? 4 Way bulxamaan, oo kibir
bay ku hadlaan, Oo xumaanfalayaasha oo dhammu way
faanaan. 5 Rabbiyow, iyagu waxay burburiyaan dadkaaga,
Oo dhaxalkaagay silciyaan. 6 Carmalka iyo shisheeyaha
ayay laayaan, Oo agoontay nafta ka qaadaan. 7 Oo waxay
isyidhaahdaan, Waxan Rabbigu ma arki doono, Oo Ilaaha
reer Yacquubna kama fikiri doono. 8 Kuwiinna doqonnada
ah oo dadka ku dhex jirow, fiirsada, Oo kuwiinna nacasyada
ahow, goormaad caqli yeelanaysaan? 9 Kii dhegta abuuray,
sow wax maqli maayo? Kii isha sameeyeyna, sow wax arki
maayo? 10 Kan quruumaha edbiyaa, sow wax hagaajin
maayo? Kaasoo ah kan dadka aqoonta bara? 11 Rabbigu
waa og yahay fikirrada binu-aadmigu Inay micnela'aan yihiin.
12 Rabbiyow, waxaa barakaysan ninkii aad edbiso, Oo aad
sharcigaaga wax ka barto, 13 Si aad uga nasiso maalmaha
belaayada Inta kan sharka lahaa godka loo qodayo. 14
Waayo, Rabbigu dadkiisa xoori maayo, Oo dhaxalkiisana
dayrin maayo. 15 Waayo, garsooriddu waxay ku soo noqon
doontaa xaqnimada, Oo inta qalbigoodu qumman yahay
oo dhammuna way raaci doonaan. 16 Bal yaa ii kacaya
oo sharfalayaasha iga hor joogsanaya? Oo yaa ii soo
istaagaya oo xumaanfalayaasha iga celinaya? 17 Rabbigu
haddaanu i caawin, Hadda naftaydu waxay joogi lahayd
meesha aamusnaanta. 18 Markaan idhi, Rabbiyow, cagtaydu
waa simbiriirixanaysaa, Waxaa kor ii qaadday naxariistaada.
19 Kolkay fikirro badan igu dhex jiraan Waxaa naftayda ka
farxiya qalbiqaboojintaada. 20 Carshiga sharnimadu ma
xidhiidh buu kula yeelanayaa, Kaasoo belaayo qaynuun ku
qabanqaabiya? 21 Waxay dhammaantood isu soo wada
urursadaan kan xaqa ah naftiisa, Oo waxay xukumaan
dhiig aan eed lahayn. 22 Laakiinse Rabbigu waxa weeye
munaaraddayda, Ilaahayna waa dhagaxii magangalkayga.
23 Oo wuxuu dushooda ku soo celiyey xumaatadoodii, Oo
wuxuu iyaga ku dhex baabbi'in doonaa sharnimadooda,
Rabbiga Ilaaheenna ahu wuu wada baabbi'in doonaa.

**95** Kaalaya, aynu Rabbiga u gabaynee, Oo aynu farxad
ugu qaylinno dhagaxa badbaadadeenna. 2 Aynu
hortiisa la nimaadno mahadnaq, Oo aynu isaga farxad ugu
qaylinno innagoo sabuurro ugu gabyayna. 3 Waayo, Rabbigu
waa Ilaah weyn, Waana boqor weyn oo ilaahyada oo dhan
ka wada sarreeya. 4 Dhulka meelihiisa ugu mool dheeru
gacantiisay ku jiraan, Oo buuraha dheeraantoodana isagaa
iska leh. 5 Baddana isagaa iska leh, oo isagaa sameeyey,
Oo dhulka engeganna isagaa gacmihiisa ku sameeyey. 6
Haddaba kaalaya aynu isaga caabudnee oo u sujuudnee,
Oo Rabbiga ina abuuray aan hortiisa ku jilba joogsanno, 7
Waayo, isagu waa Ilaaheen, Oo innaguna waxaynu nahay
dadkii daaqsintiisa, iyo idaha gacantiisa ku jira. Bal maanta
maad codkiisa maqashaan! 8 Qalbigiinna ha adkaynina,
sidii markii Meriibaah la joogay, Iyo sidii maalintii la joogay
Masaah oo cidlada ku dhex taal, 9 Markay awowayaashiin i
jirrabeen, Oo ay i tijaabiyeen, oo ay shuqulkaygii arkeen. 10
Dadkii qarnigaas afartan sannadood waan u cadhaysnaa,
Oo waxaan idhi, Waa dad qalbigooda ka qaldama, Oo iyagu
ma ay aqoon jidadkaygii, 11 Sidaas daraaddeed anigoo
cadhaysan waxaan ku dhaartay Inaanay nasashadayda
gelin.

**96** Rabbiga gabay cusub ugu gabya, Dadka dhulka oo
dhammow, Rabbiga u gabya. 2 Rabbiga u gabya, oo
magiciisa ammaana, Oo badbaadintiisana muujiya maalin ka
maalin. 3 Ammaantiisa quruumaha dhexdooda ka sheega,
Oo shuqulkiisa yaabka badanna dadyowga oo dhan ka dhex
sheega. 4 Waayo, Rabbigu waa weyn yahay, waana mudan
yahay in aad loo ammaano. Isaga waa in laga cabsadaa
in ka sii badan ilaahyada oo dhan. 5 Waayo, dadyowga
ilaahyadooda oo dhammu waa sanamyo, Laakiinse Rabbigu
isagaa sameeyey samooyinka. 6 Sharaf iyo haybaduba
hortiisay yaalliin, Xoog iyo quruxuna meeshiisa quduuska ah

ayay ku jiraan. 7 Dadka qolooyinkiisow, Rabbiga ammaana,
Waxaad Rabbiga ka sheegtaan ammaan iyo xoog. 8
Waxaad Rabbiga ka sheegtaan ammaanta magiciisu mudan
yahay, Qurbaan keena, oo barxadihiisa soo gala. 9 Rabbiga
ku caabuda quruxda quduusnimada, Dadka dhulka oo
dhammow, hortiisa ku gariira. 10 Quruumaha dhexdooda
waxaad ka tidhaahdaan, Rabbigaa taliya, Oo duniduna waxay
u dhisan tahay si aan la dhaqaajin karin, Dadyowgana wuxuu
ugu garsoori doonaa caddaalad. 11 Haddaba samooyinku
ha farxeen, dhulkuna ha reyreeyo, Oo badda iyo waxa
ka buuxaaba, ha guuxeen, 12 Berriga iyo waxa ku jira
oo dhammuna ha farxeen, Oo markaasay dhirta duurka
oo dhammu Rabbiga hortiisa ku gabyi doonaan farxad
daraaddeed, 13 Waayo, isagu waa imanayaa, Oo wuxuu
u imanayaa inuu dunida xukumo. Isagu wuxuu dunida ku
xukumi doonaa xaqnimo, Dadyowgana runtiisa.

97 Rabbigu isagaa taliya, haddaba dhulku ha reyreeyo,
Oo gasiiradaha badanuna ha wada farxeen. 2 Isaga
waxaa ku wareegsan daruuro iyo gudcur, Oo carshigiisana
waxaa aasaas u ah xaqnimo iyo garsoorid. 3 Waxaa hortiisa
socda dab, Oo wuxuu wada gubaa cadaawayaashiisa ku
wareegsan. 4 Hillaaciisii ayaa dunida iftiimiyey, Dhulkuna
wuu arkay, wuuna gariiray. 5 Buurihii waxay Rabbiga hortiisa
ugu dhalaaleen sidii shamac oo kale, Iyagoo hor jooga
Sayidka dhulka oo dhan. 6 Samooyinku waxay sheegaan
xaqnimadiisa, Oo dadyowga oo dhammuna waxay arkaan
ammaantiisa. 7 Kuwa sanamyada la qoray u adeega
Iyo weliba kuwa sanamyada ku faana oo dhammu ha
ceeboobeen, Ilaahyada oo dhammow, isaga caabuda.
8 Rabbiyow, Siyoon way maqashay, wayna faraxday,
Oo gabdhihii reer Yahuudahna waxay ku reyreeyeen
garsooriddaadii. 9 Waayo, Rabbiyow, adigu waad ka
sarraysaa dhulka oo dhan, Oo aad baa lagaaga sarraysiiyey
ilaahyada oo dhan. 10 Kuwiinna Rabbiga jeclow, sharka
nebcaada, Isagu wuxuu dhawraa nafaha quduusiintiisa, Oo
wuxuu iyaga ka samatabbixiyaa gacanta kuwa sharka leh.
11 Waxaa kuwa xaqa ah loo beeray iftiin, Kuwa qalbigoodu
qumman yahayna, farxad. 12 Kuwiinna xaqa ahow, Rabbiga
ku farxa, Oo magiciisa quduuska ah ku mahadnaqa.

98 Rabbiga gabay cusub ugu gabya, Waayo, isagu wuxuu
sameeyey waxyaalo yaab badan, Gacantiisa midig iyo
dhudhunkiisa quduuska ahuna waxay keeneen badbaado.
2 Rabbigu wuxuu dadka ogeysiiyey badbaadadiisii, Oo
xaqnimadiisiina wuxuu bayaan ugu muujiyey quruumaha
hortooda. 3 Oo wuxuu soo xusuustay naxariistiisii iyo
aaminnimadiisii uu u qabay reerka binu Israa'iil, Dadka dhulka
darfihiisa jooga oo dhammu way wada arkeen badbaadinta
Ilaaheenna. 4 Inta dhulka joogta oo dhammay, Rabbiga
farxad ugu qayliya, Dhawaaqa, oo farxad ku gabya, oo
ammaan ku gabya. 5 Rabbiga ammaan ugu gabya idinkoo
kataarad haysta, Kataarad iyo codka heeska ugu gabya.
6 Boqorka Rabbiga ah hortiisa farxad kaga dhawaajiya
Turumbooyin iyo buunan. 7 Badda iyo waxa ka buuxaaba
ha guuxeen, Dunida iyo kuwa dhex deggan oo dhammuna
ha dhawaaqeen, 8 Webiyadu ha sacbiyeen, Oo buuruhuna
dhammaantood farxad ha kaga gabyeen Rabbiga hortiisa,
9 Waayo, isagu wuxuu u imanayaa inuu dhulka xukumo,
Wuxuu dunida ku xukumi doonaa xaqnimo, Dadyowgana
caddaalad.

99 Rabbigu isagaa taliya, dadyowgu ha gariireen,
Isagu wuxuu ku fadhiyaa keruubiimta, dhulku ha
dhaqdhaqaaqo. 2 Rabbigu Siyoon dhexdeeda waa ku weyn
yahay, Oo dadyowga oo dhanna wuu ka wada sarreeyaa. 3
Iyagu ha ammaaneen magacaaga weyn oo laga cabsado,
Isagu waa quduus. 4 Oo weliba boqorka xooggiisu wuxuu
jecel yahay garsoorid, Caddaalad baad adkaysaa, Garsoorid
iyo xaqnimo baad u samaysaa reer Yacquub. 5 Rabbiga
Ilaaheenna ah sarraysiiya, Oo meeshuu cagaha saartona ku
sujuuda, Isagu waa quduus. 6 Muuse iyo Haaruun waxay
ka mid ahaayeen wadaaddadiisa, Samuu'eelna wuxuu ka
mid ahaa kuwa magiciisa u yeedha, Iyagu waxay baryeen
Rabbiga, oo isna wuu u jawaabay. 7 Wuxuu iyagii kala
dhex hadlay tiirkii daruurta ahaa, Iyana waxay xajiyeen
markhaatifurkiisii iyo qaynuunkii uu iyaga siiyey. 8 Rabbiyow
Ilaahayagiiyow, waad u jawaabtay, Oo waxaad ahayd Ilaah
iyaga cafiyey, In kastoo aad falimahoodii ka aargoosatay. 9
Rabbiga Ilaaheenna ah sarraysiiya, Oo isaga ku caabuda
buurtiisa quduuska ah, Waayo, Rabbiga Ilaaheenna ahu
waa quduus.

100 Inta dhulka deggan oo dhammay, Rabbiga farxad
ugu qayliya. 2 Rabbiga farxad ugu adeega, Oo
hortiisa gabay la kaalaya. 3 Ogaada in Rabbigu Ilaah
yahay, Waxaa ina sameeyey isaga, oo waxaynu nahay
kuwiisii, Waxaynu nahay dadkiisii iyo idihii daaqsintiisa. 4
Irdihiisa mahadnaqid la gala, Barxadihiisana ammaan. Isaga
u mahadnaqa, oo magiciisa ammaana. 5 Waayo, Rabbigu
waa wanaagsan yahay, naxariistiisuna weligeed way sii
waartaa, Aaminnimadiisuna tan iyo ka ab ka ab.

101 Waxaan ka gabyi doonaa naxariis iyo garsoorid,
Rabbiyow, waxaan kuugu gabyi doonaa ammaan. 2
Oo waxaan u dhawrsan doonaa si qumman oo caqliya, Bal

goormaad ii iman doontaa? Waxaan gurigayga ku dhex socon
doonaa qalbi qumman. 3 Indhahayga hortooda wax xun ma
dhigi doono, Waan necbahay kuwa leexda shuqulkooda,
Oo innaba iguma dhegi doono. 4 Qalbi qalloocanu wuu iga
fogaan doonaa, Oo innaba wax shar ah ma aqoon doono. 5
Kii qarsoodi u xanta deriskiisa, kaas waan baabbi'in doonaa,
Kii isla madax weyn oo qalbigiisu kibirsan yahayna uma
dulqaadan doono. 6 Indhahaygu waxay la jiri doonaan kuwa
aamiinka ah oo dalka deggan, si ay iila joogaan aawadeed,
Kii si qumman u socda ayaa ii adeegi doona. 7 Kii khiyaano
ka shaqeeyaase gurigayga ma joogi doono, Kii been ku
hadlaana hortayda kuma xoogaysan doono. 8 Subax ilaa
ka subax ayaan wada baabbi'in doonaa kuwa sharka leh
oo dalka deggan oo dhan, Si aan magaalada Rabbiga uga
baabbi'iyo kuwa xumaanta ka shaqeeya oo dhan.

**102** Rabbiyow, baryootankayga maqal, Qayladayduna ha
ku soo gaadho. 2 Wejigaaga ha iga qarin maalinta
aan dhibaataysnahay, Dhegta ii dhig, Oo maalinta aan ku
baryo, dhaqso iigu soo jawaab. 3 Waayo, maalmahaygu
waxay u dhammaadaan sida qiiq oo kale, Oo lafahayguna
waxay u gubtaan sida qori ololaya oo kale. 4 Wadnahayga
wax baa lagu dhuftay, sida caws oo kalena wuu engegay,
Waayo, waan iska illoobaa inaan kibistayda cuno. 5
Codkii taahiddayda daraaddiis Ayaa lafahaygu jidhkayga
ku dhegaan. 6 Anigu waxaan la mid ahay haad cantalyaa
ah oo cidlada joogta, Oo waxaan la mid noqday haad
guumays ah oo lamadegaanka dhex joogta. 7 Waan soo
jeedaa, oo waxaan noqday Sidii shimbir yar oo keligeed guri
dhaladiis saaran. 8 Maalinta oo dhan cadaawayaashaydu
way i caayaan, Oo kuwa ii cadhaysanuna magacaygay ku
caytamaan. 9 Waayo, dambas baan u cunay sidii kibis oo
kale, Oo cabniinkaygiina waxaan ku darsaday ilmadaydii.
10 Sababtuna waa dhirifkaagii iyo cadhadaadii aawadood,
Waayo, kor baad ii qaadday, dabadeedna waad i xoortay.
11 Cimrigaygu waa sida hoos sii libdhaya, Oo waxaan
u engegay sida caws oo kale. 12 Laakiinse Rabbiyow,
adigu weligaaba waad sii jiri doontaa, Oo waa lagu sii
xusuusan doonaa ka ab ka ab. 13 Waad sara joogsan
doontaa, oo Siyoon baad u naxariisan doontaa, Waayo, waa
wakhtiga iyada loo jixinjixo, haah, oo wakhtigii la ballamay
waa yimid. 14 Waayo, addoommadaadu waxay u bogaan
dhagaxyadeeda, Oo waxay u jixinjixaan ciiddeeda. 15
Haddaba quruumuhu waxay ka cabsan doonaan magaca
Rabbiga, Boqorrada dunida oo dhammuna ammaantaada,
16 Waayo, Rabbigu wuxuu dhisay Siyoon, Oo wuxuu ka
dhex muuqday ammaantiisii, 17 Wuxuu u fiirsaday kuwa dan
daraysan tukashadoodii, Oo baryadoodiina ma uu quudhsan.
18 Tan waxaa loo qori doonaa farcanka soo socda, Oo
dad la abuuri doono ayaa Rabbiga ammaani doona. 19
Waayo, isagu wuxuu wax ka soo fiiriyey meeshiisa sare
oo quduuska ah, Rabbigu dhulkuu ka soo eegay samada,
20 Inuu maqlo taaha maxbuuska, Iyo inuu sii daayo kuwa
dilka lagu xukumay, 21 Si dadku magaca Rabbiga uga
sheego Siyoon dhexdeeda, Ammaantiisana Yeruusaalem
dhexdeeda, 22 Markii dadyowgu isu soo wada ururaan,
Iyo xataa boqortooyooyinkuba, inay Rabbiga u adeegaan
aawadeed. 23 Isagu xooggayguu ku dhex dhimay jidka, Oo
cimrigaygiina wuu gaabiyey. 24 Anigu waxaan idhi, Ilaahayow,
ha i sii qaadin cimrigayga oo badh ah, Sannadahaagu
waxay sii waaraan tan iyo ka ab ka ab. 25 Waa hore ayaad
aasaaska dhulka dhigtay, Samooyinkuna waa shuqulkii
gacmahaaga. 26 Iyagu way baabbi'i doonaan, adiguse waad
sii waari doontaa, Haah, oo kulligood waxay u duugoobi
doonaan sida dhar oo kale, Oo waxaad iyaga u beddeli
doontaa sida maro oo kale, wayna beddelmi doonaan, 27
Laakiinse adigu isku si uun baad tahay had iyo goorba,
Oo sannadahaaguna ma idlaan doonaan. 28 Carruurta
addoommadaadu way sii jiri doonaan, Oo farcankooduna
hortaaday ku xoogaysan doonaan.

**103** Naftaydoy, Rabbiga ammaan, Oo inta igu jirta oo
dhammay, ammaana magiciisa quduuska ah. 2
Naftaydoy, Rabbiga ammaan, Oo ha illoobin wanaagga uu
kuu sameeyo oo dhan. 3 Isagaa kaa cafiya dembiyadaada oo
dhan, Oo kaa bogsiiya cudurradaada oo dhan, 4 Oo naftaada
ka badbaadiya halligaadda, Oo raxmad iyo naxariis kugu
barakeeya, 5 Oo kaa dhergiya waxyaalaha wanwanaagsan,
Si ay dhallinyaranimadaadu ugu cusboonaato sida gorgorka
oo kale. 6 Rabbigu wuxuu falaa xaqnimo, Gar buuna u
gooyaa kuwa dulman oo dhan. 7 Isagu wuxuu Muuse
garansiiyey jidadkiisii, Reer binu Israa'iilna falimihiisii. 8
Rabbigu waa raxmad badan yahay, waana nimco miidhan,
Cadho wuu u gaabiyaa, waana naxariis badan yahay. 9 Isagu
had iyo goor wax canaanan maayo, Oo sii cadhaysnaan
maayo ilaa weligiis. 10 Isagu inoolama uu macaamiloon sidii
dembiyadeennu ahaayeen, Oo inooguma uu abaalmarin
sidii xumaatooyinkeennu ahaayeen. 11 Waayo, sida samadu
dhulka uga sarrayso, Sidaas oo kalaa naxariistiisu ugu
weyn tahay kuwa isaga ka cabsada. 12 Sida barigu uga fog
yahay galbeedka, Sidaas oo kaluu xadgudubkeennii inooga
fogeeyey. 13 Sida aabbe carruurtiisa ugu naxo oo kale Ayaa
Rabbigu ugu naxaa kuwa isaga ka cabsada. 14 Waayo,
abuuristeennuu og yahay, Oo wuu xusuusan yahay inaan
innagu ciid nahay. 15 Laakiinse dadka cimrigiisu waa sida

doog oo kale, Sida ubaxa berrinka ayuu u barwaaqoobaa.
16 Waayo, dabayl baa dul marta, wuuna baabba'aa, Oo
meeshiisiina mar dambe ma aqoon doonto. 17 Laakiinse
Rabbigu wuxuu u naxariistaa kuwa isaga ka cabsada weligiis
iyo weligiisba, Oo xaqnimadiisuna waxay la jirtaa carruurta
carruurteeda, 18 Kuwaas oo ah kuwa axdigiisa xajiya Iyo kuwa
amarradiisa xusuusta oo wada yeela. 19 Rabbigu carshigiisii
wuxuu ka dhistay samooyinka, Oo boqortooyadiisuna wax
walbay u talisaa. 20 Malaa'igihiisa xoogga badan oo eraygiisa
oofiya Oo codka hadalkiisa maqlow, Rabbiga ammaana. 21
Rabbiga ammaana, ciidammadiisa oo dhammow, Idinkoo ah
midiidinyadiisa wuxuu doonayo sameeyow, 22 Shuqulladiisa
oo dhammow, Rabbiga ku ammaana Meel kasta oo
dowladnimadiisa ahba, Naftaydoy, Rabbiga ammaan.

**104** Naftaydoy, Rabbiga ammaan. Rabbiyow Ilaahayow,
aad baad u weyn tahay, Oo waxaad huwan tahay
murwad iyo haybad. 2 Waxaad sida maro u huwataa nuur,
Oo samooyinkana waxaad u kala bixisaa sida daah oo kale.
3 Waxa qolkaaga saqafka u hayana waxaad dhigtaa biyaha
dhexdooda, Daruurahana waxaad ka dhigataa gaadhifaras,
Oo waxaad ku kor socotaa dabaysha baalasheeda, 4
Waxaad dabaysha ka dhigataa wargeeyayaashaada, Oo
waxaad midiidinyadaada ka dhigataa dab ololaya, 5 Adigaa
dhigay aasaaska dhulka, Si aanu weligiis u dhaqdhaqaaqin.
6 Waxaad ku dabooshay mool sidii dhar oo kale, Biyihiina
waxay joogsadeen buuraha korkooda. 7 Canaantaadii
ayay ku carareen, Oo codkii onkodkaaga ayay haddiiba
ka baxsadeen, 8 Waxay kor u fuuleen buuraha, oo waxay
hoos ugu dhaadheceen dooxooyinka, Ilaa meeshii aad u
samaysay. 9 Waxaad iyaga u dhigtay xudduud aanay soo
dhaafin, Si aanay mar kale u noqon oo aanay dhulka u
daboolin. 10 Isagu dooxooyinka wuxuu ku soo daayaa ilo,
Iyana waxay durduraan buuraha dhexdooda, 11 Waxay
waraabiyaan xayawaanka duurka jooga oo dhan, Oo
dameerdibadeedyaduna way harraad beelaan. 12 Haadda
samadu iyagay ag degganaadaan, Oo waxay ka dhex
gabyaan laamaha. 13 Buuraha wuxuu ka waraabiyaa
qolalkiisa, Dhulkuna wuxuu ka dheregsan yahay midhihii
shuqulladaada. 14 Isagu wuxuu ka dhigaa in dooggu xoolaha
u soo baxo, Oo geedaha yaryarna wuxuu u soo bixiyey
in dadku ku isticmaalo, Inuu dhulka cunto ka soo bixiyo,
15 Iyo khamri ka farxiya dadka qalbigiisa, Iyo saliid uu
wejiga ku dhaashado, Iyo kibis qalbiga dadka xoogaysa.
16 Rabbiga dhirtiisu waa dheregsan tahay, Kuwaas oo ah
geedaha kedar la yidhaahdo oo Lubnaan oo uu isagu beeray,
17 Kuwaas oo ah meesha shimbirruhu buulkooda ay ka
samaystaan, Xuurtuna gurigeeda waxay ka kor dhisataa
geedaha waaweyn. 18 Buuraha dhaadheer waxaa leh riyaha
dibadda, Dhagaxyada waaweynuna waxay gabbaad u yihiin
walooyinka. 19 Isagu dayaxa wuxuu u sameeyey xilliyo, Oo
qorraxduna dhicitinkeeda way taqaan. 20 Waxaad samaysaa
gudcur, oo habeen baa yimaada, Markaasay xayawaanka
duurku soo wada baxaan. 21 Libaaxyada aaranka ahu
waxay u ciyaan ugaadhsigooda, Cuntadoodana waxay ka
sugaan xagga Ilaah. 22 Oo kolkii qorraxdu soo baxdana
way noqdaan, Oo waxay iska seexdaan godadkooda. 23
Dadku waa u soo baxaa shuqulkiisa Iyo hawshiisa ilaa
tan iyo fiidka. 24 Rabbiyow, shuqulladaadu tiro badanaa!
Kulligoodna xigmad baad ku samaysay, Dhulka waxaa ka
buuxa hodantinimadaada. 25 Halkoo waxaa ku taal bad
weyn oo ballaadhan, Gudaheedana waxaa ku jira waxyaalo
gurguurta oo aan la tirin karin, Iyo xayawaan waaweyn iyo
kuwo yaryarba. 26 Halkaas waxaa ku socda doonniyo, Oo
waxaa halkaas yaal bahal badeed oo Lewiiyaataan la odhan
jiray oo aad u abuurtay inuu ku dhex cayaaro. 27 Kuwaas
oo dhammu adigay kaa sugaan, Inaad cuntadooda siiso
wakhti ku habboon. 28 Oo waxaad iyaga siiso ayay isu soo
urursadaan, Gacantaadaad furtaa oo waxay ka dhergaan
waxyaalo wanaagsan. 29 Wejigaagaad qarisaa, oo way
dhibtoodaan, Naftoodaad ka qaaddaa oo way dhintaan,
Oo waxay ku noqdaan ciiddoodii. 30 Waxaad soo dirtaa
ruuxaaga, kolkaasay iyagu abuurmaan, Dhulkana waad
cusboonaysiisaa. 31 Rabbiga ammaantiisu ha sii raagto
weligeedba, Oo Rabbigu ha ku reyreeyo shuqulladiisa.
32 Isagu dhulkuu eegaa, oo wuu gariiraa, Wuxuu taabtaa
buuraha, oo way qiiqaan. 33 Intaan noolahay oo dhan
ayaan Rabbiga u gabyi doonaa, Oo Ilaahay ayaan ammaan
ugu gabyi doonaa intaan jiro oo dhan. 34 Fikirkaygu isaga
ha u macaanaado, Rabbigaan ku rayrayn doonaa. 35
Dembilayaashu dhulka ha ka baabbe'een, Oo kuwa sharka
lahuna yaanay mar dambe sii jirin. Naftaydoy, Rabbiga
ammaan. Rabbiga ammaana.

**105** Rabbiga ku mahadnaqa, oo magiciisa ku barya,
Falimihiisana dadyowga ka dhex sheega. 2 Isaga
u gabya, oo ammaan ugu gabya, Shuqulladiisa yaabka
badan oo dhanna ka hadla. 3 Ku faana magiciisa quduuska
ah, Kuwa Rabbiga doondoona qalbigoodu ha reyreeyo. 4
Rabbiga iyo xooggiisa doondoona, Oo weligiinba wejigiisa
doondoona. 5 Xusuusta shuqulladiisii yaabka badnaa oo
uu sameeyey, Iyo cajaa'ibyadiisii iyo xukummadii afkiisa,
6 Kuwiinna farcankii addoonkiisii Ibraahim ahow, Kuwiisa
uu doortay oo reer Yacquub ahow. 7 Isagu waa Rabbiga
Ilaaheenna ah, Xukummadiisuna waxay ku jiraan dhulka

oo dhan. 8 Axdigiisuu soo xusuustay weligiisba, Kaasoo
ah hadalkiisii uu kun farcan ku amray, 9 Kaasu waa axdigii
uu Ibraahim la dhigtay, Oo uu Isxaaq ugu dhaartay, 10
Oo isla kaas wuxuu u adkeeyey oo qaynuun uga dhigay
Yacquub, Oo Israa'iilna wuxuu uga dhigay axdi weligiis
jiraya, 11 Oo wuxuu ku yidhi, Dalka Kancaan waxaan kuu
siinayaa Inuu ahaado qaybtii dhaxalkiinna, 12 Markay dad
tiro yar ahaayeen, Oo ay aad u yaraayeen, qariibna dalka ku
ahaayeen, 13 Oo iyagu quruunba quruun bay uga bexeen,
Oo intay boqortooyo ka tageen ayay dad kale u gudbeen.
14 Isagu ninna uma oggolaanin inuu wax yeelo, Haah, oo
daraaddood ayuu boqorro u canaantay, 15 Oo wuxuu ku
yidhi, Ha taabanina kuwayga subkan, Oo nebiyadaydana
waxba ha yeelina. 16 Dhulkiina abaar buu ugu yeedhay inay
ku dhacdo, Ushii cuntada oo ay ku tiirsanaayeen oo dhanna
wuu wada jebiyey. 17 Oo nin buu iyaga ka sii hor diray, Kaas
oo ahaa Yuusuf oo loo iibiyey addoon ahaan. 18 Cagihiisii
waxay ku xanuujiyeen bircago, Oo naftiisii waxay gashay
silsilado bir ah, 19 Ilaa wakhtigii eraygiisu noqday Eraygii
Rabbiga ayaa isaga tijaabiyey. 20 Markaasaa boqorkii u cid
diray oo furay, Kaas oo ahaa taliyihii dadyowga, wuuna sii
daayay. 21 Oo wuxuu isagii ka dhigay sayidkii reerkiisa,
Iyo taliyihii maalkiisa oo dhan, 22 Inuu amiirradiisa xidho
markuu doonayoba, Oo uu odayaashiisana xigmad baro.
23 Israa'iilna wuxuu yimid dalkii Masar, Yacquubna wuxuu
qariib ahaan u joogay dalkii Xaam. 24 Oo isagu dadkiisii aad
buu u badiyey, Oo wuxuu ka dhigay inay ka xoog bataan
cadaawayaashoodii. 25 Qalbigoodii wuxuu u beddelay si
ay dadkiisa u nebcaadaan, Iyo si ay addoommadiisa u
khiyaaneeyaan. 26 Wuxuu u soo diray addoonkiisii Muuse,
Iyo Haaruun oo uu doortay. 27 Oo waxay dhexdooda ku
sameeyeen calaamooyinkiisii, Oo dalkii Xaamna waxay
ku sameeyeen yaabab. 28 Wuxuu u soo diray gudcur,
dalkiina gudcur buu ka dhigay, Oo iyana hadalkiisii kuma
ay caasiyoobin. 29 Biyahoodii wuxuu u beddelay dhiig, Oo
kalluunkoodiina wuu wada laayay. 30 Rahyo waa ku bateen
dhulkoodii Iyo qolalka boqorkoodiiba. 31 Isagu waa hadlay,
markaasaa waddankoodii oo dhan Waxaa yimid duqsi faro
badan iyo injir. 32 Oo roob ahaan wuxuu u siiyey roob
dhagaxyaale, Dalkoodiina wuxuu ku soo daayay dab ololaya.
33 Wuxuu wax ku dhuftay geedahoodii canabka ahaa iyo
geedahoodii berdaha ahaaba, Oo dhirtii waddankooda ku
tiilna wuu jejebiyey. 34 Wuu hadlay, markaasaa waxaa
yimid ayax, Iyo diir aan la tirin karin, 35 Oo waxay wada
cuneen geedo yaryar oo kasta oo dalkooda ku yiil, Wayna
dhammaysteen midhihii dhulkooda. 36 Oo weliba wuxuu
wada laayay curadyadii dalkooda oo dhan, Kuwaas oo ahaa
bilowgii xooggooda. 37 Oo wuxuu dibadda u bixiyey reer binu
Israa'iil iyagoo wata lacag iyo dahab, Oo qabiilooyinkiisiina
mid taagdarani kuma uu jirin. 38 Reer Masarna way ku
farxeen kolkay ambabbexeen, Waayo, cabsidoodii baa
ku dhacday. 39 Wuxuu korkooda ku kala bixiyey daruur
inay qariso, Iyo dab habeenkii iftiin u noqda. 40 Wax bay
weyddiisteen, markaasuu u keenay digaag duur, Oo wuxuu
ka dhergiyey kibistii samada. 41 Dhagaxii ayuu dillaaciyey,
markaasay biyo ka soo buqdeen, Oo meelihii engegnaa
ayay ku durdureen sidii webi oo kale. 42 Waayo, wuxuu
soo xusuustay eraygiisii quduuska ahaa, Oo uu kula hadlay
addoonkiisii Ibraahim. 43 Dadkiisiina wuxuu soo bixiyey
iyagoo faraxsan, Kuwii uu doortayna iyagoo gabyaya. 44 Oo
wuxuu iyagii siiyey dalalkii quruumaha, Oo iyana waxay hanti
ahaan u qaadeen waxay dadyowgu ku hawshoodeen, 45
Inay amarradiisa dhawraan, Oo ay qaynuunnadiisa xajiyaan.
Rabbiga ammaana.

**106** Rabbiga ammaana. Rabbiga ku mahadnaqa, waayo,
isagu waa wanaagsan yahay, Oo naxariistiisuna
weligeedba way waartaa. 2 Yaa sheegi kara Rabbiga
falimihiisa waaweyn? Amase yaa muujin kara ammaantiisa
oo dhan? 3 Waxaa barakaysan kuwa xukunka dhawra,
Oo xaqnimada ka shaqeeya wakhti kastaba. 4 Rabbiyow,
igu soo xusuuso naxariista aad dadkaaga u qabto, Oo igu
soo booqo badbaadintaada, 5 Inaan arko kuwaaga aad
dooratay barwaaqadooda, Oo aan ku reyreeyo farxadda
quruuntaada, Iyo inaan la faano dadka dhaxalkaaga ah. 6
Waxaannu la dembaabnay awowayaashayo, Xumaanna
waannu samaynay, oo si shar ah ayaannu wax u samaynay.
7 Awowayaashayo ma ay garan yaababkii aad dalka Masar
ku samaysay. Oo ma ay xusuusan badnaantii naxariistaada,
Laakiinse way ku ag caasiyoobeen badda, taas oo ah
Badda Cas. 8 Habase yeeshee wuxuu iyagii u badbaadiyey
magiciisa daraaddiis, Inuu xooggiisa weyn ka dhigo mid
la yaqaan. 9 Oo weliba Badda Cas ayuu canaantay,
kolkaasay engegtay, Sidaas daraaddeed wuxuu iyagii ku
hor kacay moolka dhexdiisii sidii iyagoo maraya cidlada
dhexdeeda. 10 Oo wuxuu iyagii ka badbaadiyey kii iyaga
necbaa gacantiisii, Oo wuxuu ka furtay gacantii cadowga. 11
Biyihiina waxay qariyeen cadaawayaashoodii. Xataa mid
qudhahu kama hadhin. 12 Markaasay rumaysteen erayadiisii,
Oo ammaantiisay ku gabyeen. 13 Haddiiba way illoobeen
shuqulladiisii, Oo taladiisiina ma ay sugin, 14 Laakiinse aad
bay wax u damacsanaayeen intay cidladii dhex joogeen, Oo
Ilaahna way ku jirrabeen lamadegaanka dhexdiisa. 15 Oo isna
wuxuu siiyey wixii ay weyddiisteen, Laakiinse wuxuu naftoodii

u soo diray caatow. 16 Oo weliba waxay xerada dhexdeedii
kaga hinaaseen Muuse Iyo Haaruun oo ahaa Rabbiga kiisii
quduuska ahaa. 17 Oo dhulkiina waa kala furmay oo wuxuu
liqay Daataan, Oo weliba wuxuu qariyey Abiiraam guutadiisii.
18 Oo guutadoodiina dab baa ka dhex shidmay, Ololkiina
wuxuu wada gubay kuwii shar lahaa. 19 Waxay samaysteen
weyl markii ay Xoreeb joogeen, Oo waxay caabudeen sanam
la shubay. 20 Oo sidaasay ammaantoodii ugu beddeleen
Dibi caws daaqa ekaantiis. 21 Waxay illoobeen Ilaahii
Badbaadiyahooda ahaa, Oo waxyaalo waaweyn ku sameeyey
dalkii Masar, 22 Shuqullo yaab badanna ku sameeyey dalkii
Xaam, Waxyaalo cabsi badanna ku sameeyey Badda Cas
agteeda. 23 Sidaas daraaddeed isagu wuxuu yidhi, Waan
baabbi'inayaa. Laakiinse Muuse oo ahaa kii uu doortay
ayaa hortiisa u istaagay xidhiidhla'aantii u dhexaysay, Inuu
Ilaah cadhadiisa ka leexiyo aawadeed si aanu iyaga u
baabbi'in. 24 Waxay quudhsadeen dalkii wacnaa, Mana ay
rumaysan eraygiisii, 25 Laakiinse teendhooyinkooday ku
dhex gunuunaceen, Mana ay dhegaysan codkii Rabbiga.
26 Sidaas daraaddeed gacantiisuu kor ugu taagay iyaga,
Oo wuxuu ku dhaartay inuu iyaga cidladii ku afgembiyo, 27
Iyo inuu farcankooda ku afgembiyo quruumaha dhexdooda,
Oo uu iyaga ku kala firdhiyo dalalka. 28 Oo weliba waxay
isku dareen Bacal Fecoor, Oo waxay cuneen allabarigii
kuwii dhintay. 29 Sidaasay isaga shuqulladoodii ugaga
xanaajiyeen, Markaasay belaayadu ka dhex dillacday. 30
Markaasaa waxaa istaagay Fiinexaas, oo wuxuu ku soo
dejiyey xukun, Oo sidaasaa belaayada lagu joojiyey. 31
Oo taas waxaa isagii loogu tiriyey xaqnimo U sii waaraysa
qarni kasta iyo weligeedba. 32 Oo weliba waxay isagii kaga
cadhaysiiyeen biyihii Meriibaah agtooda, Sidaas daraaddeed
dhib baa ku dhacday Muuse iyaga aawadood, 33 Maxaa
yeelay, iyagu waxay ku caasiyoobeen ruuxiisii, Kolkaasuu
fiirola'aan u hadlay. 34 Dadyowgiina uma ay baabbi'in, Sidii
Rabbigu ugu amray iyaga, 35 Laakiinse iyagu waxay ku dhex
qasmeen quruumihii, Shuqulladoodiina way barteen, 36 Oo
waxay u adeegeen sanamyadoodii, Kuwaasoo iyaga dabin u
noqday, 37 Haah, oo waxay wiilashoodii iyo gabdhahoodii
allabari ahaan ugu qaleen jinniyo, 38 Oo waxay daadiyeen
dhiig aan eed lahayn, kaasoo ah dhiiggii wiilashooda iyo kii
gabdhahooda Oo ay allabari ahaan ugu qaleen sanamyadii
reer Kancaan, Oo dalkiina wuxuu ku nijaasoobay dhiig.
39 Haddaba sidaasay shuqulladoodii ugu nijaasoobeen,
Oo falimahoodii ayay ku caasiyoobeen sidii dhillo oo kale.
40 Sidaas daraaddeed ayaa Rabbigu dadkiisii aad ugu
cadhooday, Oo isna wuxuu karhay dadkii dhaxalkiisii ahaa. 41
Oo wuxuu iyagii u gacangeliyey quruumaha, Oo kuwii iyaga
necbaa ayaa u taliyey. 42 Oo weliba cadaawayaashoodii
ayaa dulmay, Oo iyagoo gacantooda ka hooseeya ayay
addoonsadeen. 43 Marar badan ayuu samatabbixiyey,
Laakiinse waxay ku caasiyoobeen taladoodii, Oo waxaa
lagu hoosaysiiyey dembigoodii. 44 Habase yeeshee isagu
waa ka fiirsaday cidhiidhigoodii, Markuu qayladoodii maqlay,
45 Oo wuxuu iyagii u soo xusuustay axdigiisii, Kolkaasuu
naxariistiisa badan aawadeed u qoomamooday. 46 Oo weliba
wuxuu ka dhigay inay Kuwii iyaga maxaabiis ahaanta u
kaxaystay oo dhammu u naxaan. 47 Rabbiyow Ilaahayagow,
na badbaadi, Oo quruumaha naga soo dhex ururi, Si aannu
magacaaga quduuska ah ugu mahadnaqno, Oo aannu
ammaantaada ugu guulaysanno. 48 Waxaa mahad leh
Rabbiga ah Ilaaha reer binu Israa'iil Tan iyo weligiis iyo
weligiisba. Oo dadka oo dhammu ha yidhaahdo, Aamiin.
Rabbiga ammaana.

**107** Rabbiga ku mahadnaqa, waayo, isagu waa
wanaagsan yahay, Oo naxariistiisuna weligeedba
way sii waartaa. 2 Kuwa Rabbigu soo furtay sidaas ha
yidhaahdeen, Waana kuwa uu isagu ka soo furtay gacantii
cadowga, 3 Oo uu ka soo ururiyey dalalka, Xagga bari, iyo
xagga galbeed, Xagga woqooyi, iyo xagga koonfureedba.
4 Waxay dhex wareegi jireen cidlada iyo jid lamadegaan
ah, Mana ay helin magaalo ay degaan. 5 Way gaajoodeen,
wayna harraadeen, Oo naftoodiina way ku dhex taag
darnaatay. 6 Markaasay Rabbiga u qayshadeen iyagoo
dhibban, Oo isna wuu ka samatabbixiyey dhibaatooyinkoodii.
7 Oo weliba wuxuu iyagii ku hoggaamiyey jid toosan,
Si ay u tagaan magaalo ay degaan. 8 Dadku muu
Rabbiga ku ammaano wanaaggiisa, Iyo shuqulladiisa yaabka
badan oo uu binu-aadmiga u sameeyo! 9 Waayo, isagu
wuxuu dhergiyaa nafta aad wax u doonaysa, Oo nafta
gaajaysanna wuxuu ka dhergiyaa wanaagga. 10 Kuwii
dhex fadhiyey gudcurkii iyo hooskii dhimashada, Oo ku
xidhnaa dhibaatada iyo birta, 11 Waxay ku caasiyoobeen
erayadii Ilaah, Oo waxay fududaysteen taladii Ilaaha ugu
sarreeya, 12 Sidaas daraaddeed ayuu qalbigoodii daal ku
soo dejiyey, Wayna dheceen, mid iyaga caawiyaana ma jirin.
13 Markaasay Rabbiga u qayshadeen iyagoo dhibban, Oo
isna wuu ka badbaadiyey dhibaatooyinkoodii. 14 Wuxuu
ka soo dhex bixiyey gudcurkii iyo hooskii dhimashada,
Silsiladihii ku xidhnaana wuu kala jejebiyey. 15 Dadku
muu Rabbiga ku ammaano wanaaggiisa, Iyo shuqulladiisa
yaabka badan oo uu binu-aadmiga u sameeyo! 16 Waayo,
irdihii naxaasta ahaa wuu kala jejebiyey, Qataarradii birta
ahaana wuu burburiyey. 17 Nacasyadu waxay u dhibban

yihiin xadgudubkooda aawadiis, Iyo xumaatooyinkooda
aawadood. 18 Naftoodu waxay nacdaa cunto kasta, Oo waxay
ku soo dhowaadaan irdaha dhimashada. 19 Markaasay
Rabbiga u qayshadaan iyagoo dhibban, Oo isna wuxuu
ka soo badbaadiyaa dhibaatooyinkooda. 20 Wuxuu soo
diraa eraygiisa, wuuna bogsiiyaa iyaga, Oo wuxuu ka
samatabbixiyaa halligaaddooda. 21 Dadku muu Rabbiga
ku ammaano wanaaggiisa, Iyo shuqulladiisa yaabka badan
oo uu binu-aadmiga u sameeyo! 22 Iyagu allabariga
mahadnaqidda ha bixiyeen, Oo shuqulladiisa gabay ha
ku sheegeen. 23 Kuwa badda doonniyaha ku mara, Oo
shuqulkooda ku sameeya biyaha badan, 24 Kuwaasu waxay
arkaan Rabbiga shuqulladiisa, Iyo yaababkiisa moolka
ku jira. 25 Waayo, wuxuu amraa oo kiciyaa dabaysha
duufaanka, Taas oo kor u qaadda hirarka badda. 26 Waxay
u kacaan xagga samada, oo haddana waxay hoos ugu
soo dhacaan moolalka, Naftoodiina waxay ku dhalaashay
dhibaato daraaddeed. 27 Hore iyo dib bay isaga daba
noqdaan, oo sida nin sakhraan ah bay dhacdhacaan, Oo
waxay sameeyaan ayay garan waayaan. 28 Markaasay
Rabbiga u qayshadaan iyagoo dhibban, Oo isna wuxuu
ka soo bixiyaa dhibaatooyinkooda. 29 Wuxuu dejiyaa
duufaanka, Si ay hirarkiisu u xasillaan. 30 Way farxaan,
maxaa yeelay, way xasilloon yihiin, Oo sidaasuu iyaga ku
keenaa marsada ay doonayaan. 31 Dadku muu Rabbiga ku
ammaano wanaaggiisa, Iyo shuqulladiisa yaabka badan oo
uu binu-aadmiga u sameeyo! 32 Iyagu ha ku sarraysiiyeen
shirka dadka dhexdiisa, Oo ha ku ammaaneen fadhiga
odayaasha. 33 Isagu webiyo wuxuu u beddelaa cidlo, Oo
ilo biyo ahna wuxuu u beddelaa dhul oommane ah, 34
Oo dhul barwaaqaysanna wuxuu u beddelaa lamadegaan
cusbo leh, Oo waana kuwa halkaas deggan xumaantooda
aawadeed. 35 Cidlada wuxuu u beddelaa balli biyo ah,
Oo dhul engeganna wuxuu u beddelaa ilo biyo ah. 36 Oo
halkaasuu kuwa gaajaysan dejiyaa, Si ay u samaystaan
magaalo ay degaan, 37 Oo ay beeraha u abuurtaan, oo ay
beero canab ah u beertaan, Oo ay u helaan midho tiro badan.
38 Oo weliba iyaga wuu barakeeyaa, sidaas daraaddeed aad
bay u tarmaan, Oo weliba uma uu oggolaado in xoolahoodu
yaraadaan. 39 Oo haddana way sii dhinmaan, oo waxay la
fooorsadaan Dulmi iyo dhib iyo murug. 40 Amiirro wuxuu
ku soo daayaa quudhsasho, Oo wuxuu ka dhigaa inay
ku wareegaan cidlada aan jid lahayn. 41 Oo weliba kan
baahanna dhibaatada ayuu ka sara mariyaa, Oo wuxuu u
yeelaa qolooyin ah sidii adhi oo kale. 42 Kuwa qummanuna
way arki doonaan, wayna ku farxi doonaan, Oo kolkaas
xumaanta oo dhammu afkeeday xidhi doontaa. 43 Ku alla kii
caqli lahu wuu dhawri doonaa waxyaalahan, Oo iyana way
ka fiirsan doonaan Rabbiga naxariistiisa.

**108** Ilaahow, qalbigaa ii fadhiya, Waan gabyi doonaa,
haah, waxaan kuugu gabyi doonaa ammaantayda.
2 Shareerad iyo kataaradow, toosa, Aroorta hore waan toosi
doonaa. 3 Rabbiyow, mahad baan kuugu naqi doonaa
dadyowga dhexdooda, Oo waxaan ammaan kuugu gabyi
doonaa quruumaha dhexdooda. 4 Waayo, naxariistaadu
way ku weyn tahay samooyinka korkooda, Oo runtaaduna
waxay gaadhaa ilaa daruuraha. 5 Ilaahow, samooyinka
ka sarree, Oo ammaantaaduna dhulka oo dhan ha ka
sarrayso, 6 Si ay kuwaad jeceshahay u samatabbaxaan
aawadeed, Gacantaada midig ku badbaadi, oo ii jawaab.
7 Ilaah wuxuu ku hadlay quduusnimadiisa oo yidhi, Anigu
waan farxi doonaa, Shekem waan kala qaybin doonaa,
oo waxaan qiyaasi doonaa dooxada Sukod, 8 Gilecaad
anigaa iska leh, Manasehna anigaa iska leh, Oo weliba
Efrayimna waa daafacaaddii madaxayga, Yahuudahna waa
ushaydii boqornimo. 9 Moo'aab waa weelkaygii aan ku
maydhan jiray, Edomna kabahaygaan ku dul tuuri doonaa,
Oo Falastiinna waan ku qaylin doonaa. 10 Bal yaa i geeyn
doona magaalada deyrka leh? Yaase xagga Edom ii kaxayn
doona? 11 Ilaahow, sow nama aadan xoorin? Ilaahow, lama
soo baxdid ciidammadayada. 12 Cadowga naga caawi,
Waayo, binu-aadmiga caawimaaddiisu waxtar ma leh. 13
Ilaah caawimaaddiisa ayaannu wax xoog leh ku samayn
doonnaa, Waayo, isagaa ah kan cadaawayaashayada ku
tuman doona.

**109** Ilaaha ammaantaydow, ha iska aamusin, 2 Waayo,
waxay igu kala qaadeen afka kan sharka leh iyo kan
khiyaanada lehba, Oo waxay igula hadleen carrab been
sheega. 3 Oo weliba waxay igu hareereeyeen erayo nacayb
badan, Oo sababla'aan bay igula dirireen. 4 Anigoo jecel
bay cadow ii yihiin, Laakiinse anigu Ilaah baan baryaa.
5 Wanaag waxay iigaga abaalgudeen xumaan, Jacaylna
nacayb. 6 Nin shar leh ka sarraysii isaga, Oo Shayddaan
ha istaago midigtiisa. 7 Markii la xukumo, ha soo baxo
isagoo dembi lagu helay, Oo tukashadiisiina dembi ha
noqoto. 8 Cimrigiisu ha yaraado, Jagadiisana mid kale ha
qaato. 9 Carruurtiisu ha agoontoobeen, Naagtiisuna carmal
ha noqoto. 10 Carruurtiisu kuwa warwareega ha noqdeen
oo ha dawarsadeen, Cuntadoodana ha ka doondooneen
meelahooda cidlada ah. 11 Midka korsaarta qaataa ha
qabsado wuxuu haysto oo dhan, Oo shisheeyayaalna ha
ka dheceen wixii uu ku hawshooday. 12 Yaanu jirin mid
isaga u sii naxariistaa, Oo yaanu jirin mid u naxa carruurtiisa

agoonta ah. 13 Farcankiisu ha baabba'o, Oo qarniga soo
socda magacooda ha la tirtiro. 14 Xumaantii awowayaashiis
Rabbigu ha soo xusuusto, Oo dembigii hooyadiisna yaan la
tirtirin. 15 Rabbiga ha hor joogeen had iyo goorba, Si uu
xusuustooda uga gooyo dhulka. 16 Maxaa yeelay, isagu
wuu xusuusan waayay inuu u naxariisto Miskiinka, iyo kan
baahan, iyo kan qalbiga ka murugaysan, Laakiinse wuxuu u
silciyey inuu iyaga laayo aawadeed. 17 Wuxuu jeclaaday
habaaridda, markaasaa habaar ku soo degay, Ducaynta
kuma farxin, ducona way ka sii fogaatay isaga. 18 Oo weliba
isagu wuxuu sidii dharkiisii u huwaday habaaridda, Oo iyana
waxay gashay uurkiisa hoose sidii biyo oo kale, Oo lafihiisana
waxay u gashay sidii saliid. 19 Isaga ha u ahaato sida
marada uu huwado, Iyo sida dhex-xidhka uu ku xidho had
iyo goorba, 20 Tanu waa abaalmarinta cadaawayaashaydu
ay xagga Rabbiga ka helaan, Iyo kuwa naftayda xumaan
ka sheegaba. 21 Laakiinse Ilaahow, Sayidow, magacaaga
daraaddiis wax iigu yeel, Naxariistaadu waa wanaagsan
tahay, ee sidaas daraaddeed ii samatabbixi, 22 Waayo, anigu
waxaan ahay miskiin iyo mid baahan, Oo qalbigayguna
wuu igu dhex dhaawacmay. 23 Waxaan u dhammaaday
sida hoos sii libdhaya, Waxaan u gilgilmaa sida ayax oo
kale. 24 Jilbahaygu soon bay la taag darnaadaan, Oo
jidhkayguna baruurla'aanteed wuu la caatoobaa. 25 Oo
weliba waxaan iyaga u noqday cay, Oo kolkay i arkaan
ayay madaxa ruxruxaan. 26 Rabbiyow, Ilaahayow, i caawi,
Oo igu badbaadi si naxariistaada waafaqsan, 27 Si ay u
ogaadaan in tanu tahay shaqadii gacaantaada, Iyo inaad
taas samaysay, Rabbiyow. 28 Iyagu ha habaartameen,
adiguse i barakee, Kolkay kacaan, way ceeboobi doonaan,
laakiinse anigoo addoonkaaga ah waan rayrayn doonaa. 29
Cadaawayaashaydu sharafdarro ha xidheen, Oo ceebtooda
ha u huwadeen sida go' oo kale. 30 Afkaygaan aad ugaga
mahadnaqi doonaa Rabbiga, Haah, oo waxaan isaga ku
ammaani doonaa dadka badan dhexdiisa. 31 Waayo, isagu
wuxuu isa soo taagi doonaa miskiinka midigtiisa, Si uu uga
badbaadiyo kuwa naftiisa xukuma.

**110** Rabbigu wuxuu Sayidkayga ku yidhi, Midigtayda
fadhiiso, Ilaa aan cadaawayaashaada ka dhigo
meeshaad cagahaaga saaratid. 2 Rabbigu wuxuu Siyoon
ka soo diri doonaa ushii xooggaaga, Cadaawayaashaada
dhexdooda ka tali. 3 Dadkaagu iyagoo raalli ah bay isbixiyaan
maalintii xooggaaga, Iyagoo leh quruxda quduusnimada,
ee ka timaada uurka waaberiga, Adigaa leh sayaxa
dhallinyaranimadaada. 4 Rabbigu wuu dhaartay, kana soo
noqon maayo, oo wuxuu yidhi, Adigu weligaaba wadaad
baad tahay, Sidii derejadii Malkisadaq. 5 Sayidka midigtaada
joogaa Wuxuu maalinta cadhadiisa dooxi doonaa boqorro. 6
Isagu quruumaha dhexdooda ayuu wax ku xukumi doonaa,
Oo meel walba wuxuu ka buuxin doonaa meydad, Oo
waddammo badan ayuu madaxda ka dili doonaa. 7 Intuu
jidka socdo ayuu durdurka ka cabbi doonaa, Oo sidaas
daraaddeed ayuu madaxa kor u qaadi doonaa.

**111** Rabbiga ammaana. Qalbigayga oo dhan ayaan
Rabbiga ugaga mahadnaqi doonaa Guddiga kuwa
qumman dhexdiisa iyo ururka dhexdiisaba. 2 Shuqullada
Rabbigu way waaweyn yihiin, Oo waxaa doondoona kuwa
ku faraxsan oo dhan. 3 Shuqulkiisu waa sharaf iyo haybad,
Oo xaqnimadiisuna weligeedba way waartaa. 4 Wuxuu
ka dhigay in la sii xusuusto shuqulladiisa yaabka badan,
Rabbigu waa nimco miidhan, oo waxaa ka buuxda raxmad.
5 Wuxuu cunto siiyey kuwa isaga ka cabsada, Oo weligiisna
wuxuu xusuusnaan doonaa axdigiisii. 6 Wuxuu dadkiisii tusay
xooggii shuqulladiisa, Markii uu iyaga siiyey quruumaha
dhaxalkoodii. 7 Shuqullada gacmihiisu waa run iyo garsoorid,
Oo amarradiisa oo dhammuna waa hubaal. 8 Way sii adag
yihiin weligood iyo weligoodba, Oo waxaa lagu sameeyey
run iyo qummanaan. 9 Wuxuu dadkiisa u soo diray furasho,
Oo wuxuu amray in axdigiisu ahaado mid weligiisba waara,
Magiciisu waa quduus, waana mid laga cabsado. 10 Rabbiga
ka cabsashadiisu waa bilowga xigmadda, Kuwa sidaas
yeela oo dhammu waxay leeyihiin waxgarasho wanaagsan,
Ammaantiisu way waartaa weligeedba.

**112** Rabbiga ammaana. Waxaa barakaysan ninkii
Rabbiga ka cabsada, Oo aad ugu farxa amarradiisa.
2 Farcankiisu wuxuu ku xoog badnaan doonaa dhulka, Kuwa
qumman farcankooduna wuu barakoobi doonaa. 3 Gurigiisa
waxaa ku jira maal iyo taajirnimo, Xaqnimadiisuna weligeedba
way sii waartaa. 4 Kuwa qumman iftiin baa gudcurka uga
soo baxa, Isagu waa nimco miidhan, oo waxaa ka buuxda
raxmad, waana xaq. 5 Waxaa nimcaysan ninkii naxariis leh
oo dadka wax amaahiya, Kaasu danihiisuu ku wadi doonaa
caddaalad. 6 Waayo, isaga weligiis lama dhaqaajin doono,
Oo kii xaq ah weligiisba waa la xusuusan doonaa. 7 Isagu
innaba kama cabsan doono war xun, Qalbigaa u fadhiya,
oo wuxuu isku halleeyaa Rabbiga. 8 Qalbigaa u fadhiya,
oo ma uu cabsan doono, Ilaa uu wuxuu doonayay ku arko
cadaawayaashiisa. 9 Wax buu kala qaybshay, oo wuxuu
wax siiyey kuwii baahnaa, Xaqnimadiisuna way sii waartaa
weligeedba, Geeskiisana waxaa lagu sarraysiin doonaa
sharaf. 10 Kii shar lahu wuu arki doonaa, wuuna cadhoon
doonaa, Wuu ilko jirriqsan doonaa, oo wuu dhalaali doonaa,
Kuwa sharka leh doonistoodu way baabbi'i doontaa.

**113** Rabbiga ammaana. Rabbiga addoommadiisow, ammaana. Rabbiga magiciisa ammaana. **2** Hadda intii ka bilaabata iyo tan iyo weligeedba Rabbiga magiciisu mahad ha lahaado. **3** Qorraxdu markay soo baxdo iyo markay dhacdo inta ka dhex leh Magaca Rabbiga waa in la ammaano. **4** Rabbigu quruumaha oo dhan wuu ka wada sarreeyaa, Ammaantiisuna samooyinka way ka sii sarraysaa. **5** Bal yaa la mid ah Rabbiga Ilaaheenna ah, Oo kursigiisa ku leh xagga sare, **6** Oo hoos u eega Waxyaalaha samada ku jira iyo waxyaalaha dhulka yaalba? **7** Wuxuu miskiinka kor uga qaadaa ciidda, Oo kan baahanna wuxuu sara uga qaadaa meesha digada, **8** Inuu isaga la fadhiisiyo amiirro, Kuwaas oo ah amiirrada dadkiisa. **9** Oo naagtii madhalays ahna wuxuu ka dhigaa inay reer hayso, Iyo inay ahaato hooyo faraxsan oo carruur leh. Rabbiga ammaana.

**114** Markay reer binu Israa'iil Masar ka soo bexeen, Oo ay reerkii Yacquub dad af qalaad ka soo bexeen, **2** Ayaa Yahuudah noqday meeshiisa quduuska ah, Israa'iilna noqday meeshuu u talinayay. **3** Baddii way aragtay, wayna carartay, Webi Urdunna dib baa loo celiyey. **4** Buurihii waxay u boodboodeen sidii wanan, Kurihiina sidii baraar. **5** Baddoy, bal maxaa kugu dhacay oo aad u cararaysaa? Webi Urdunow, maxaad dib ugu noqonaysaa? **6** Buurahow, bal maxaad ugu boodboodaysaan sida wanan? Kuraha yaryarow, bal maxaad ugu boodboodaysaan sida baraar? **7** Dhulkow, ku gariir Sayidka hortiisa, Ilaaha reer Yacquub hortiisa ku gariir, **8** Kaas oo dhagaxii u beddelay balli biyo ah, Oo dhagaxmadowgiina u beddelay il biyo ah.

**115** Rabbiyow, yaanay noo ahaan, yaanay noo ahaan, Laakiinse magacaaga ammaani ha u ahaato, Naxariistaada iyo runtaada daraaddood. **2** Bal maxay quruumuhu u odhanayaan, Haddaba Ilaahoodu meeh? **3** Laakiinse Ilaahayagu samooyinkuu ku jiraa, Oo wax alla wixii uu doonayayna wuu sameeyey. **4** Sanamyadoodu waa lacag iyo dahab, Oo waa wax dad gacmaha ku sameeyey. **5** Waxay leeyihiin af, laakiinse ma hadlaan, Indhona way leeyihiin, laakiinse waxba ma arkaan, **6** Dhegona way leeyihiin, laakiinse waxba ma maqlaan, Sanna way leeyihiin, laakiinse waxba ma urshaan, **7** Gacmo way leeyihiin, laakiinse waxba ma qabtaan, Cagona way leeyihiin, laakiinse ma socdaan, Oo hungurigoodana hadal kama soo saaraan. **8** Kuwa iyaga sameeyaana sidooda oo kale ayay noqon doonaan, Iyo xataa mid kasta oo iyaga isku halleeyaba. **9** Reer binu Israa'iilow, Rabbiga isku halleeya, Isagu waa caawimaaddooda iyo gaashaankooda. **10** Reer Haaruunow, Rabbiga isku halleeya, Isagu waa caawimaaddooda iyo gaashaankooda. **11** Kuwiinna Rabbiga ka cabsadow, Rabbiga isku halleeya, Isagu waa caawimaaddooda iyo gaashaankooda. **12** Rabbigu aad buu inoo xusuusnaa, wuu ina barakayn doonaa, Reerka Israa'iilna wuu barakayn doonaa, Reerka Haaruunna wuu barakayn doonaa. **13** Wuxuuna barakayn doonaa kuwa Rabbiga ka cabsada, Yar iyo weynba. **14** Rabbigu aad iyo aad ha idiin kordhiyo, Idinka iyo carruurtiinnaba. **15** Rabbiga sameeyey samada iyo dhulka Ayaa idin barakeeyey. **16** Samooyinku waa samooyinkii Rabbiga, Laakiinse dhulka wuxuu siiyey binu-aadmiga. **17** Kuwii dhintay Rabbiga ma ay ammaanaan, Kuwa hoos ugu dhaadhaca meesha aamusnaantana ma ay ammaanaan isaga, **18** Laakiinse annagu Rabbiga waannu ammaani doonnaa Haatan intii ka bilaabata iyo tan iyo weligeedba. Rabbiga ammaana.

**116** Rabbiga waan jeclahay, maxaa yeelay, wuxuu maqlay Codkaygii iyo baryootankaygii. **2** Dhegtuu ii dhigay, Sidaas daraaddeed isagaan baryi doonaa intaan noolahay oo dhan. **3** Xadhkihii dhimashada ayaa i hareereeyey, Xanuunkii She'oolna waa i qabsaday. Oo waxaan la kulmay dhib iyo murug. **(Sheol h7585)** **4** Markaasaan ku baryootamay magaca Rabbiga, Anigoo leh, Rabbiyow, naftayda samatabbixi. **5** Rabbigu waa nimco miidhan, waana xaq, Haah, oo Ilaaheennu waa naxariis badan yahay. **6** Rabbigu kuwa garaadka daran wuu dhawraa, Hoos baa la ii soo dejiyey, kolkaasuu i badbaadshay. **7** Naftaydoy, nasashadaadii ku noqo, Waayo, Rabbigu wax badan oo wanaagsan buu kuu sameeyey. **8** Waayo, naftayda waxaad ka samatabbixisay dhimasho, Indhahaygana ilmo, Cagahaygana kufid. **9** Waxaan ku socon doonaa Rabbiga hortiisa Anigoo dhex jooga dalka kuwa nool. **10** Waan rumaysnaa, oo markaan hadlay Aad baa la ii dhibay, **11** Anigoo degdegsan baan waxaan idhi, Dadka oo dhammu waa beenaalayaal. **12** Bal maxaan Rabbiga uga celiyaa Waxyaalihii uu ii taray oo dhan? **13** Waxaan qaadan doonaa koobka badbaadada, Oo magaca Rabbiga ayaan ku baryootami doonaa. **14** Rabbiga ayaan u oofin doonaa nidarradaydii, Oo weliba waxaan ku bixin doonaa dadkiisa oo dhan hortooda. **15** Rabbiga hortiisa dhimashada quduusiintiisa Ayaa qiimo weyn ku leh. **16** Rabbiyow, sida runta ah waxaan ahay addoonkaaga, Waxaan ahay addoonkaaga, oo ah wiilka addoontaada, Silsiladahaygii waad iga furtay. **17** Waxaan kuu soo bixin doonaa allabarigii mahadnaqidda, Oo magaca Rabbiga ayaan ku baryootami doonaa. **18** Rabbiga ayaan u oofin doonaa nidarradaydii, Oo weliba waxaan ku bixin doonaa dadkiisa oo dhan hortooda, **19** Iyo guriga Rabbiga barxadihiisa, Iyo dhexdaada, Yeruusaalemay. Rabbiga ammaana.

**117** Quruumaha oo dhammow, Rabbiga ammaana,
Dadyowga oo dhammow, ammaana isaga. 2 Waayo,
naxariistiisu xaggeenna waa ku weyn tahay, Rabbiga
runtiisuna weligeedba way waartaa. Rabbiga ammaana.

**118** Rabbiga ku mahadnaqa, maxaa yeelay, isagu waa
wanaagsan yahay, Waayo, naxariistiisu weligeedba
way waartaa. 2 Haddaba reer binu Israa'iil ha yidhaahdeen,
Naxariistiisu weligeedba way waartaa. 3 Oo reerka Haaruun
hadda ha yidhaahdeen, Naxariistiisu weligeedba way
waartaa. 4 Oo kuwa Rabbiga ka cabsadaa hadda ha
yidhaahdeen, Naxariistiisu weligeedba way waartaa. 5 Anigoo
cidhiidhi ku jira ayaan Rabbiga u qayshaday, Markaasaa
Rabbigu ii jawaabay, oo wuxuu i taagay meel ballaadhan. 6
Rabbigu waa ila jiraa, oo anigu ma cabsan doono, Bal maxaa
dad igu samayn karaa? 7 Rabbigu waa ila jiraa, oo wuxuu ku
dhex jiraa kuwa i caawinaya, Haddaba waxaan kuwa i neceb
ku arki doonaa waxaan doonayo. 8 Intii dad lagu kalsoonaan
lahaa Waxaa ka wanaagsan in Rabbiga laysku halleeyo. 9
Intii amiirro lagu kalsoonaan lahaa Waxaa ka wanaagsan in
Rabbiga laysku halleeyo. 10 Quruumihii oo dhammu way i
wada hareereeyeen, Oo anna magaca Rabbiga ayaan ku
baabbi'in doonaa. 11 Way i hareereeyeen, haah, oo way i
hareereeyeen, Oo anna magaca Rabbiga ayaan ku baabbi'in
doonaa. 12 Waxay ii hareereeyeen sida shinni oo kale, oo
iyaga waxaa loo demiyey sida dabka qodxanta oo kale,
Oo anna magaca Rabbiga ayaan ku baabbi'in doonaa. 13
Adigu aad baad igu mudday si aan u dhaco aawadeed,
Laakiinse Rabbigaa i caawiyey. 14 Rabbigu waa xooggayga
iyo gabaygayga, Oo wuxuu ii noqday badbaadadayda.
15 Kuwa xaq ah teendhooyinkooda waxaa ku jira codkii
rayraynta iyo badbaadada, Gacanta midig oo Rabbiguna wax
xoog leh bay samaysaa. 16 Gacanta midig oo Rabbiga waa
la sarraysiiyey, Gacanta midig oo Rabbiguna wax xoog leh
bay samaysaa. 17 Anigu ma dhiman doono, laakiinse waan
noolaan doonaa, Oo waxaan sheegi doonaa shuqullada
Rabbiga. 18 Rabbigu aad buu ii edbiyey, Laakiinse dhimasho
iima uu dhiibin. 19 Irdaha xaqnimada iga fura, Oo anna
waan geli doonaa, oo Rabbigaan ku mahadnaqi doonaa.
20 Tanu waa iriddii Rabbiga, Oo waxaa geli doona kuwa
xaqa ah. 21 Waan kugu mahadnaqi doonaa, waayo, waad
ii jawaabtay, Oo waxaad ii noqotay badbaadadayda. 22
Dhagaxii kuwa wax dhisaa ay diideen, Kaasu wuxuu noqday
madaxa rukunka. 23 Tanu xagga Rabbiga bay ka timid,
Oo waa ku yaab indhahayaga. 24 Tanu waa maalinta
Rabbigu sameeyey, Waannu rayrayn doonnaa oo waannu
farxi doonnaa. 25 Rabbiyow, waan ku baryaynaaye, haatan
na badbaadi, Oo waan ku baryaynaaye, Rabbiyow, haatan
barwaaqo noo soo dir. 26 Waxaa barakaysan kan Rabbiga
magiciisa ku imanaya, Waxaannu idinka ammaannay guriga
Rabbiga. 27 Rabbigu waa Ilaah, oo wuxuu na siiyey iftiin,
Allabariga xadhko ku xidha tan iyo meesha allabariga
geeseheeda. 28 Waxaad tahay Ilaahay, oo anna waan kugu
mahadnaqi doonaa, Waxaad tahay Ilaahay, oo waan ku
sarraysiin doonaa. 29 Rabbiga ku mahadnaqa, waayo, isagu
waa wanaagsan yahay, Oo naxariistiisuna weligeedba way
waartaa.

**119** Waxaa barakaysan kuwa jidka ku qumman, Oo
sharciga Rabbiga ku socda. 2 Waxaa barakaysan
kuwa dhawra markhaatifurkiisa, Oo Rabbiga ku doondoona
qalbiga oo dhan. 3 Haah, oo xaqdarro ma sameeyaan,
Jidadkiisase way ku socdaan. 4 Waxaad nagu amartay
amarradaada, Inaan aad u dhawrno. 5 Aad baan u jeclaan
lahaa in jidadkayga la hagaajiyo Inaan qaynuunnada
dhawro! 6 Markaas anigu ceeboobi maayo, Markaan dhawro
amarradaada oo dhan. 7 Markaan barto xukummadaada
xaqa ah Ayaan qummanaanta qalbiga kuugu mahadnaqi
doonaa. 8 Waxaan dhawri doonaa qaynuunnadaada,
Rabbow, ha i dayrin weligay. 9 Bal nin dhallinyaro ahu
muxuu jidkiisa ku nadiifiyaa? Waa inuu aad ugu fiirsado
si eraygaaga waafaqsan. 10 Waxaan kugu doondoonay
qalbigayga oo dhan, Yaanan amarradaada ka leexan. 11
Waxaan eraygaagii qalbigayga ugu kaydsaday Si aanan
kuugu dembaabin. 12 Rabbiyow, adigaa mahad leh, Haddaba
qaynuunnadaada i bar. 13 Waxaan bushimahayga ku
sheegay Xukummadii afkaaga oo dhan. 14 Waxaan ku
reyreeyey jidka markhaatifurkaaga, Sidaan ugu rayrayn
lahaa taajirnimada oo dhan. 15 Waxaan aad ugu fiirsan
doonaa amarradaada, Oo jidadkaagaan dhawri doonaa.
16 Qaynuunnadaada waan ku farxi doonaa, Eraygaagana
ma illoobi doono. 17 Anoo addoonkaaga ah wax badan oo
wanaagsan ii samee, si aan u noolaado, Oo sidaasaan
eraygaaga u dhawri doonaa. 18 Indhahayga fur Si aan
waxyaalo yaab badan sharcigaaga uga arko. 19 Socotaan
dhulka ku ahay, Haddaba amarradaada ha iga qarin. 20
Naftaydu waxay u xiisootay Jacaylkay had iyo goorba
u qabto xukummadaada. 21 Waxaad canaanatay kuwa
kibirsan oo inkaaran, Oo amarrada ka leexda. 22 Cay iyo
ceeb iga fogee, Waayo, markhaatifurkaaga waan xajiyey,
23 Oo weliba amiirraa fadhiistay oo wax iga gees ah ka
wada hadlay, Laakiinse anoo addoonkaaga ah aad baan
uga fiirsaday qaynuunnadaada. 24 Markhaatifurkaagu waa
waxa iga farxiya, Waana lataliyayaashayda. 25 Naftaydu

waxay ku dhegtaa ciidda, Haddaba ii noolee si eraygaaga waafaqsan. 26 Waxaan kuu sheegay jidadkaygii, oo adna waad ii jawaabtay, Bal qaynuunnadaada i bar. 27 Jidka amarradaada i garansii, Oo sidaasaan aad ugu fiirsan doonaa shuqulladaada yaabka badan. 28 Naftaydu waxay la dhacdaa murug, Haddaba ii xoogee si eraygaaga waafaqsan. 29 Jidka beenta iga fogee, Oo si raxmad leh sharcigaaga ii sii. 30 Waxaan doortay jidka aaminnimadaada, Oo waxaan hortayda dhigay xukummadaadii. 31 Markhaatifurkaaga waan xajiyaa, Rabbiyow, ha i ceebayn. 32 Waxaan ku ordi doonaa jidka amarradaada Markii aad qalbigayga ballaadhisid. 33 Rabbiyow, jidka qaynuunnadaada i bar, Waanan xajin doonaa tan iyo ugu dambaysta. 34 Waxgarasho i sii, oo anna sharcigaaga waan xajin doonaa, Haah, oo waxaan ku dhawri doonaa qalbigayga oo dhan. 35 Igu kexee waddada amarradaada, Waayo, kaasaan ku farxaa. 36 Qalbigayga u soo jeedi xagga markhaatifurkaaga, Oo ha u leexin xagga faa'iidada xaqdarrada ah. 37 Indhahayga inay fiiriyaan wax aan micne lahayn ka sii jeedi, Oo jidadkaaga igu noolee. 38 Eraygaaga ii xaqiiji anoo addoonkaaga ah Oo doonaya inaan kaa cabsado. 39 Caydayda aan ka cabsanayo iga leexi, Waayo, xukummadaadu waa wanaagsan yihiin. 40 Bal eeg, waxaan u xiisooday amarradaada, Haddaba xaqnimadaada igu soo noolee. 41 Rabbiyow, naxariistaada iyo weliba badbaadintaadu Ha iigu yimaadeen si eraygaaga waafaqsan. 42 Markaasaan jawaab u heli doonaa kan i caaya, Waayo, waxaan isku halleeyaa eraygaaga. 43 Oo erayga runta ahna dhammaantiis afkayga ha ka gooyn, Waayo, waxaan rajo ku qabay xukummadaada. 44 Markaasaan had iyo goorba dhawri doonaa sharcigaaga Weligay iyo weligayba. 45 Oo waxaan ku socon doonaa xorriyad, Waayo, waxaan doondoonay amarradaada. 46 Oo weliba waxaan markhaatifurkaaga ka sheegi doonaa boqorro hortooda, Mana ceeboobi doono. 47 Oo waxaan ku farxi doonaa amarradaada Aan jeclaaday. 48 Oo weliba waxaan gacmaha u hoorsan doonaa amarradaada aan jeclaaday, Oo aad baan ugu fiirsan doonaa qaynuunnadaada. 49 Xusuuso eraygii aad anoo addoonkaaga ah igula hadashay, Oo aad igu rajo gelisay. 50 Oo taasu waa i qalbi qaboojisaa markii aan dhibaataysnahay, Waayo, eraygaagaa i soo nooleeyey. 51 Kuwa kibirsan aad bay iigu qosleen, Laakiinse sharcigaaga kama aan leexan. 52 Rabbiyow, tan iyo mar hore waxaan soo xusuusnaa xukummadaada, Waanan isqalbi qaboojiyey. 53 Aad baan u xanaaqay, Waana kuwa sharka leh oo sharcigaaga ka tegey aawadood. 54 Qaynuunnadaadu waxay ii ahaayeen heeso Markaan ku jiray gurigii aan socotada ku ahaa. 55 Rabbiyow, habeenkaan magacaaga soo xusuustay, Oo sharcigaagaan dhawray. 56 Taasu waa ii ahaatay, Maxaa yeelay, amarradaadii baan xajiyey. 57 Rabbigu waa qaybtayda, Oo anigu waxaan idhi, Waxaan dhawrayaa erayadaada. 58 Qalbigayga oo dhan ayaan kugu baryay inaad raalli iga ahaato, Si eraygaaga waafaqsan iigu naxariiso. 59 Waxaan ka fikiray jidadkayga, Kolkaasaan cagahayga u soo duway xagga markhaatifurkaaga. 60 Waan u degdegay, oo kama aan raagin Inaan amarradaada dhawro. 61 Waxaa isku kay duudduubay xadhkihii kuwa sharka leh, Laakiinse sharcigaaga ma aan illoobin. 62 Waxaan kici doonaa habeenbadhka inaan kugu mahadnaqo, Waana xukummadaada caddaaladda ah daraaddood. 63 Anigu waxaan wehel la ahay kuwa kaa cabsada oo dhan, Iyo kuwa amarradaada dhawraba. 64 Rabbiyow, dhulka waxaa ka buuxda naxariistaada, Haddaba qaynuunnadaada i bar. 65 Rabbiyow, anoo addoonkaaga ah waxaad iila macaamilootay Si wanaagsan oo eraygaaga waafaqsan. 66 Haddaba i bar kaladoorasho wanaagsan iyo aqoon, Waayo, waxaan rumaystay amarradaada. 67 Intaan lay dhibin ka hor ayaan ambaday, Laakiinse haatan eraygaaga waan dhawraa. 68 Waad wanaagsan tahay, oo wanaag baad samaysaa, Haddaba qaynuunnadaada i bar. 69 Kuwa kibirka lahu been bay iga sheegeen, Aniguse amarradaada ayaan ku xajin doonaa qalbigayga oo dhan. 70 Qalbigoodu wuu qallafsanaaday, Aniguse waxaan ku farxaa sharcigaaga. 71 Waa ii wanaagsanayd in lay dhibo, Si aan qaynuunnadaada u barto. 72 Sharciga afkaagu waa iiga sii fiican yahay Kumanyaal dahab iyo lacag ah. 73 Waxaa i sameeyey oo i qabanqaabiyey gacmahaaga, Haddaba i sii waxgarasho aan amarradaada ku barto. 74 Kuwa kaa cabsadaa way i arki doonaan, wayna farxi doonaan, Maxaa yeelay, waxaan rajo ku qabay eraygaaga. 75 Rabbiyow, waan ogahay in xukummadaadu ay xaq yihiin, Iyo inaad aaminnimo igu dhibtay. 76 Waan ku baryayaaye raxmaddaadu ha ii noqoto qalbiqaboojin Si waafaqsan eraygii aad anoo addoonkaaga ah igula hadashay. 77 Naxariistaadu ha ii timaado si aan u noolaado, Waayo, waxaa iga farxiya sharcigaaga. 78 Kuwa kibirka lahu ha ceeboobeen, waayo, si gardarro ah ayay igu afgembiyeen, Aniguse waxaan aad uga fiirsan doonaa amarradaada. 79 Kuwa kaa cabsadaa ha ii soo noqdeen, Oo waxay ogaan doonaan markhaatifurkaaga. 80 Qalbigaygu qaynuunnadaada ha ku qummanaado, Si aanan u ceeboobin. 81 Naftaydu waa u taag darnaataa badbaadintaada aan u xiisoodo aawadeed, Laakiinse eraygaagaan rajo ku qabaa. 82 Sidii aan u lahaa, Goormaad i qalbi qaboojinaysaa? Ayaa indhahaygu u gudheen eraygaaga aawadiis. 83 Waayo, waxaan noqday sidii sibraar qiiq ku dhex jiro,

Laakiinse innaba qaynuunnadaada ma aan illoobo. 84 Anoo
addoonkaaga ah cimrigaygu waa intee? Oo goormaad
xukun ku soo dejinaysaa kuwa i silciya? 85 Kuwa kibirka
leh oo aan sharcigaaga waafaqsanayn Ayaa ii qoday
godad. 86 Amarradaada oo dhammu waa wada daacad,
Si gardarro ah ayay ii silciyaan, haddaba i caawi, 87
Dhulka ayay iga baabbi'in gaadheen, Aniguse kama aan
tegin amarradaadii. 88 Raxmaddaada igu soo noolee,
Oo anna waxaan dhawri doonaa markhaatifurka afkaaga.
89 Rabbiyow, eraygaagu weligiisba Wuxuu taagan yahay
samada. 90 Aaminnimadaaduna waxay gaadhaa tan iyo
ka ab ka ab; Dhulkaad dhistay, wuuna sii jirayaa. 91
Maantadan waxay u joogaan si qaynuunnadaada waafaqsan,
Waayo, wax waluba waa addoommadaada. 92 Haddaanu
sharcigaagu iga farxin, Waxaan kol hore ku halligmi lahaa
dhibaatadii i haysatay. 93 Weligay amarradaada ma aan
illoobi doono, Waayo, iyagaad igu soo noolaysay. 94 Anigu
waxaan ahay kaaga, haddaba i badbaadi, Waayo, waxaan
doondoonay amarradaada. 95 Kuwa sharka lahu way ii
sugeen inay i baabbi'iyaan, Aniguse waxaan ka fiirsan
doonaa markhaatifurkaaga. 96 Waxaan arkay in wax kasta
oo kaamil ah ay dhammaad leeyihiin, Amarkaaguse aad buu
u ballaadhan yahay. 97 Aad baan sharcigaaga u jeclahay!
Maalinta oo dhan isagaan u fiirsadaa. 98 Amarradaadu
waxay iga dhigaan ku ka sii caqli badan cadaawayaashayda.
Waayo, weligayba way ila jiraan. 99 Waan ka sii waxgarasho
badnahay macallimiintayda oo dhan, Waayo, waxaan u
fiirsadaa markhaatifurkaaga. 100 Waan ka sii waxgarasho
badnahay odayaasha, Waayo, waxaan xajiyey amarradaada.
101 Cagahayga waan ka joojiyey jid kasta oo shar leh, Si
aan eraygaaga u dhawro. 102 Xukummadaada gees ugama
aan leexan, Waayo, wax baad i bartay. 103 Erayadaadu
dhanxanaggayga u macaan badanaa! Afkayga malab way
uga sii macaan badan yihiin! 104 Amarradaada ayaan
waxgarasho ku helaa, Oo sidaas daraaddeed ayaan jid
kasta oo been ah u necbahay. 105 Eraygaagu wuxuu
cagahayga u yahay laambad, Waddooyinkaygana iftiin.
106 Waxaan ku dhaartay oo aan weliba xaqiijiyey Inaan
dhawrayo xukummadaada xaqa ah. 107 Aad iyo aad
baan u dhibaataysnahay, Haddaba Rabbiyow, igu soo
noolee si eraygaaga waafaqsan. 108 Rabbiyow, waan ku
baryayaaye, aqbal qurbaannada ikhtiyaarka ah oo afkayga,
Xukummadaadana i bar. 109 Naftaydu had iyo goorba waxay
ku jirtaa khatar, Habase yeeshee sharcigaaga ma illoobo.
110 Kuwa sharka lahu waxay ii dhigeen dabin, Laakiinse
amarradaada kama aan amban. 111 Markhaatifurkaaga
waxaan u qaatay sida dhaxal weligiis waaraya, Waayo, kaasu
waxa weeye waxa qalbigaygu ku reyreeya. 112 Qalbigayga
waxaan u jeediyey inaan qaynuunnadaada oofiyo, Tan iyo
weligay iyo ilaa ugu dambaysta. 113 Waan necbahay kuwa
labada qalbi leh, Laakiinse sharcigaaga waan jeclahay.
114 Waxaad tahay gabbaadkayga iyo gaashaankayga, Oo
waxaan rajo ku qabaa eraygaaga. 115 Kuwiinna xumaanta
falow, iga taga, Si aan amarrada Ilaahayga u xajiyo. 116
Rabbiyow, ii tiiri si eraygaaga waafaqsan si aan u noolaado,
Oo yaanan rajadayda ku ceeboobin. 117 Kor ii hay, oo waan
badbaadi doonaa, Oo had iyo goorba waxaan u fiirsan
doonaa qaynuunnadaada. 118 Kuwa qaynuunnadaada ka
habaabay oo dhan waad fudaydsatay, Waayo, khiyaanadoodu
waa wax been ah. 119 Kuwa sharka leh oo dhulka
oo dhan waxaad u fogaysaa sida wasakh oo kale, Oo
sidaas daraaddeed baan markhaatifurkaaga u jeclahay. 120
Jidhkaygu wuxuu la gariiraa cabsidaada, Oo waxaan ka
baqaa xukummadaada. 121 Waxaan sameeyey xukun iyo
caddaalad, Haddaba ha iiga tegin kuwa i dulma. 122 Anoo
addoonkaaga ah wanaag daraaddiis ii dammiino, Oo kuwa
kibirsanu yaanay i dulmin. 123 Indhahaygii waxay u gudheen
jacaylkay badbaadintaada u qabaan, Iyo eraygaaga xaqa ah
daraaddiis. 124 Anoo addoonkaaga ah iila macaamilow si
naxariistaada waafaqsan, Oo qaynuunnadaada i bar. 125
Waxaan ahay addoonkaaga, haddaba waxgarasho i sii,
Si aan markhaatifurkaaga u ogaado. 126 Waa wakhtiga
aad shaqayn lahayd, Rabbiyow, Waayo, sharcigaaga
way buriyeen. 127 Haddaba amarradaada waan ka sii
jeclahay Dahab, haah, xataa dahab saafi ah. 128 Sidaas
daraaddeed amarradaada oo dhammu waxay ila yihiin
wax hagaagsan, Oo waan necbahay jid kasta oo been
ah. 129 Markhaatifurkaagu waa yaab badan yahay, Oo
sidaas daraaddeed ayay naftaydu u xajisaa. 130 Erayadaada
furniinkoodu wax buu iftiimiyaa, Oo wuxuu waxgarasho siiyaa
kuwa garaadka daran. 131 Afka aad baan u kala qaaday, oo
waan harraaday, Waayo, waxaan u xiisooday amarradaada.
132 Ii soo jeeso, oo ii naxariiso, Sidaad kuwa magacaaga
jecel u samaysid. 133 Tallaabooyinkayga ku toosi eraygaaga,
Oo dembina yaanu ii talin. 134 Dadka dulmigiisa iga bixi,
Oo anna waxaan dhawri doonaa amarradaada. 135 Anoo
addoonkaaga ah wejigaaga iigu iftiimi, Oo qaynuunnadaada
i bar. 136 Indhahayga waxaa ka shubma durdurro biyo ah,
Maxaa yeelay, sharcigaaga lama dhawrin. 137 Rabbiyow,
xaq baad tahay, Oo xukummadaaduna waa qumman yihiin.
138 Markhaatifurkaaga waxaad ku amartay xaqnimo Iyo
daacadnimo oo dhan. 139 Waxaa i baabba'shay qiirada
aan kuu qabo, Maxaa yeelay, cadaawayaashaydu waxay
illoobeen erayadaada. 140 Eraygaagu aad buu u daahirsan

yahay, Sidaas daraaddeed anoo addoonkaaga ah waan
jeclahay. 141 Anigu waan yarahay, oo waa lay quudhsadaa,
Laakiinse amarradaada ma illoobo. 142 Xaqnimadaadu waa
xaqnimo weligeed sii waaraysa, Oo sharcigaaguna waa run.
143 Dhib iyo cidhiidhi baa i qabsaday. Laakiinse amarradaadu
waa waxa iga farxiya. 144 Markhaatifurkaagu weligiisba waa
xaq, Haddaba waxgarasho i sii, oo anna waan sii noolaan
doonaa. 145 Waxaan ku qayshaday qalbigayga oo dhan,
haddaba Rabbiyow, ii jawaab, Oo anna waxaan xajin doonaa
qaynuunnadaada. 146 Waan kuu qayshaday ee i badbaadi,
Oo markhaatifurkaaga waan dhawri doonaa. 147 Waan ka soo
hor maray waaga berigiisii, oo waan qayliyey, Oo waxaan rajo
ku qabay erayadaada. 148 Indhahaygu way ka hor mareen
wakhtiga la soo jeedo oo habeennimo, Si aan eraygaaga uga
fikiro. 149 Codkayga u maqal si raxmaddaada waafaqsan,
Rabbiyow, igu soo noolee si xukummadaada waafaqsan. 150
Kuwii xumaatada raaci jiray way soo dhowaanayaan, Iyagu
sharcigaaga way ka fog yihiin. 151 Rabbiyow, adigu waad
dhow dahay, Oo amarradaada oo dhammuna waa wada run.
152 Waxaan markhaatifurkaaga waa hore ka iqiin Inaad u
aasaastay si ay weligood u sii waaraan. 153 Dhibaatadayda
ka fiirso oo i samatabbixi, Waayo, anigu sharcigaaga ma
illoobo. 154 Dacwadayda ii muddac, oo i soo furo, Igu
soo noolee si eraygaaga waafaqsan. 155 Kuwa sharka leh
badbaadadu waa ka fog tahay, Waayo, qaynuunnadaada ma
ay doondoonaan. 156 Rabbiyow, naxariistaadu waa badan
tahay, Igu soo noolee si xukummadaada waafaqsan. 157
Kuwa i silciya iyo cadaawayaashayduba way badan yihiin,
Laakiinse anigu kama aan leexan markhaatifurkaaga. 158
Waxaan arkay khaa'innada, kolkaasaan murugooday, Maxaa
yeelay, iyagu eraygaaga ma ay dhawraan. 159 Bal ka fiirso
sida aan amarradaada u jeclahay, Rabbiyow, igu soo noolee
si raxmaddaada waafaqsan. 160 Eraygaaga dhammaantiisu
waa run, Mid kasta oo xukummadaada xaqa ah ka mid ahu
wuu sii waaraa weligiisba. 161 Amiirraa sababla'aan ii silciyey,
Laakiinse qalbigaygu wuxuu ka baqaa erayadaada. 162
Waxaan eraygaaga ugu reyreeyaa Sidii mid booli badan helay.
163 Beenta waan necbahay oo waan karahsaday, Laakiinse
sharcigaaga waan jeclahay. 164 Maalintiiba toddoba jeer baan
ku ammaanaa, Waana xukummadaada xaqa ah daraaddood.
165 Kuwa sharcigaaga jecelu waxay haystaan nabad weyn,
Oo wax iyaga turunturreeyaa ma jiraan. 166 Rabbiyow,
badbaadintaada waan u xiisooday, Oo amarradaadiina waan
oofiyey. 167 Naftaydu waxay dhawrtay markhaatifurkaaga,
Oo anna aad iyo aad baan u jeclahay. 168 Waxaan dhawray
amarradaada iyo markhaatifurkaaga, Waayo, jidadkayga oo
dhammu hortaaday wada yaalliin. 169 Rabbiyow, qayladaydu
ha ku soo dhowaato hortaada, Oo waxgarasho ii sii si
eraygaaga waafaqsan. 170 Baryootankaygu hortaada ha
yimaado, Oo ii samatabbixi si eraygaaga waafaqsan. 171
Bushimahaygu ammaan ha ku hadleen, Waayo, waxaad
i bartaa qaynuunnadaada. 172 Carrabkaygu ha ku gabyo
eraygaaga, Waayo, amarradaada oo dhammu waa wada
xaqnimo. 173 Gacantaadu diyaar ha u ahaato inay i
caawiso, Waayo, amarradaadaan doortay. 174 Rabbiyow,
badbaadintaada, waan u xiisooday, Oo sharcigaaguna waa
waxa iga farxiya. 175 Naftaydu ha iska noolaato, wayna ku
ammaani doontaa, Oo xukummadaaduna ha i caawiyaan.
176 Waxaan u hallaabay sidii lax luntay, haddaba anigoo
addoonkaaga ah i doondoon, Waayo, amarradaada ma aan
illoobo.

**120** Anigoo cidhiidhi ku jira ayaan Rabbiga u qayshaday,
Oo isna wuu ii jawaabay. 2 Rabbiyow, naftayda ka
samatabbixi bushimo been sheega, Iyo carrab khiyaano
badan. 3 Carrabka khiyaanada badanow, bal maxaa lagu siin
doonaa? Oo maxaa kaloo laguu samayn doonaa? 4 Adoo
ah sida ku xoog badan oo fallaadhihiisa afaysan, Kuwaas oo
wata dhuxulo geed rotem la yidhaahdo. 5 Anaa hoogay,
waayo, Mesheg baan qariib ku noqday, Oo waxaan dhex
degay teendhooyinkii Qedaar! 6 Naftaydu waxay wakhti
dheer la degganayd Mid nabadda neceb. 7 Waxaan ahay
mid nabad jecel, Laakiinse kolkii aan hadlo, iyagu waa kuwa
dagaal jecel.

**121** Buurahaan indhahayga ku taagi doonaa,
Caawimaaddaydu xaggee bay ka iman doontaa? 2
Caawimaaddaydu waxay ka timaadaa Rabbiga sameeyey
samada iyo dhulka. 3 Isagu uma oggolaan doono in cagtaada
la dhaqaajiyo, Kan ku dhawraa ma gam'i doono. 4 Bal
eeg, kan reer binu Israa'iil dhawraa Ma gam'i doono, mana
seexan doono. 5 Kan ku dhawraa waa Rabbiga, Rabbigu
waa hooskaaga midigtaada taagan. 6 Qorraxdu maalinta
waxba kuma yeeli doonto. Habeenkana dayaxu waxba kuma
yeeli doono. 7 Rabbiga ayaa kaa dhawri doona shar kasta,
Isagu wuxuu dhawri doonaa naftaada. 8 Hadda intii ka
bilaabata iyo tan iyo weligeedba Rabbigu wuxuu dhawri
doonaa bixiddaada iyo soo geliddaadaba.

**122** Waan farxay markay igu yidhaahdeen, Ina keena,
aan guriga Rabbiga tagnee. 2 Yeruusaalemay,
cagahayagu Waxay taagan yihiin irdahaaga gudahooda, 3
Yeruusaalem waxaa loo dhisay Sida magaalo isku wada
dheggan, 4 Halkaasay qabiilooyinka, oo ah qabiilooyinka
Rabbigu kor ugu baxaan Inay Israa'iil u marag furaan, Iyo

inay magaca Rabbiga ku mahadnaqaan. 5 Waayo, waxaa yaalla carshiyo garsoorid loo dhigay, Waana carshiyadii reerka Daa'uud. 6 Yeruusaalem nabad ugu duceeya. Kuwa ku jecelu way barwaaqoobi doonaan. 7 Nabadu ha ku jirto derbiyadaada gudahooda, Barwaaqona ha ku jirto daarahaaga dhaadheer. 8 Walaalahay iyo rafiiqyadayda daraaddood Ayaan hadda waxaan odhanayaa, Nabadu gudahaaga ha ku jirto. 9 Rabbiga Ilaahayaga gurigiisa daraaddiis Ayaan wanaaggaaga u doondooni doonaa.

**123** Kaaga samooyinka dhex fadhiyow, Adigaan indhahayga kor kuugu taagaa. 2 Bal eeg, sida ay indhaha addoommadu u fiiriyaan gacanta sayidkooda, Iyo sida ay gabadh indhaheedu u fiiriyaan gacanta sayidaddeeda Ayay indhahayagu u fiiriyaan Rabbiga Ilaahayaga ah, Ilaa uu noo naxariisto. 3 Rabbiyow, noo naxariiso, annaga noo naxariiso, Waayo, waxaa aad nooga buuxda quudhsasho. 4 Naftayadii waxaa aad uga batay Qosolka kuwa istareexsan Iyo quudhsashadii kuwa kibirsan.

**124** Haddaan Rabbigu inala jirin Hadda reer binu Israa'iil ha yidhaahdeen, 2 Haddaan Rabbigu inala jirin, Markii dadku inagu kacay, 3 Kolkaasay innagoo noolnool ina wada liqliqi lahaayeen, Markay aad inoogu cadhoodeen, 4 Kolkaasay biyuhu ina qarqin lahaayeen, Durdurna nafteennuu dul mari lahaa, 5 Oo kolkaasay biyaha kibirsanu nafteenna dul mari lahaayeen. 6 Waxaa mahad leh Rabbiga Aan inaga dhigin ugaadh ilkahoodu ay qabsadaan. 7 Nafteennu waxay u baxsatay sida shimbir uga baxsato dabinka shimbirrodabtaha, Dabinkii wuu go'ay, innaguna waynu baxsannay. 8 Caawimaaddeennu waxay ku jirtaa magaca Rabbiga Sameeyey samada iyo dhulkaba.

**125** Kuwa Rabbiga isku halleeyaa Waa sida Buur Siyoon oo aan la dhaqaajin karin, laakiinse weligeedba sii jirta. 2 Sida buuruhu Yeruusaalem ugu wareegsan yihiin Ayuu Rabbigu dadkiisa ugu wareegsan yahay, Hadda intii ka bilaabata iyo tan iyo weligeedba. 3 Waayo, usha xumaantu ku dhici mayso qaybta kuwa xaqa ah, Si aan kuwa xaqa ahu gacmahooda xumaan ugu soo fidin. 4 Rabbiyow, kuwa wanaagsan wanaag u samee, Iyo weliba kuwa qalbigoodu qumman yahay. 5 Laakiinse kuwa geesta ugu leexda jidadkooda qalloocan Rabbigu wuxuu iyaga la kaxayn doonaa xumaanfalayaasha. Reer binu Israa'iil korkooda nabadu ha ahaato.

**126** Markii Rabbigu soo celiyey maxaabiistii Siyoon, Waxaynu noqonnay sida kuwa riyooda. 2 Markaasaa afkeenna waxaa ka buuxsamay qosol, Carrabkeennana gabay, Kolkaasaa quruumaha waxaa laga dhex yidhi, Rabbigu waxyaalo waaweyn ayuu iyaga u sameeyey. 3 Rabbigu wuxuu inoo sameeyey waxyaalo waaweyn, Oo aynu ku faraxsan nahay. 4 Rabbiyow, maxaabiisnimada mar kale nooga soo celi Sida durdurrada koonfureed. 5 Kuwa ilmada wax ku abuurtaa, farxad bay ku goosan doonaan. 6 Kii iska taga isagoo ooyaya oo abuurkiisa sita, Wuxuu soo noqon doonaa isagoo faraxsan oo xidhmooyinkiisa sita.

**127** Haddaan Rabbigu guriga dhisin, Kuwa dhisaya, waxtarla'aan bay u hawshoodaan, Haddaan Rabbigu magaalada dhawrin, Waardiyuhu micnela'aan buu u soo jeedaa. 2 Faa'iido idiinma leh inaad aroor hore kacdaan oo aad goor dambe seexataan, Oo aad kibista dhibka cuntaan, Waayo, wuxuu kuwuu jecel yahay siiyaa hurdo. 3 Bal eeg, carruurtu waa dhaxal xagga Rabbiga laga helo. Oo midhaha maxalku waa abaalgudkiisa. 4 Sida fallaadho ku jira nin xoog badan gacantiis, Sidaasoo kale weeye carruurta dhallinyaranimadu. 5 Waxaa barakaysan ninkii gabooyihiisa ka buuxsada iyaga, Iyagu ma ay ceeboobi doonaan Markay cadaawayaashooda kula hadlaan xagga iridda.

**128** Waxaa barakaysan mid kasta oo Rabbiga ka cabsada, Oo jidadkiisa ku socda. 2 Waayo, waad cuni doontaa waxa gacmahaagu ku hawshoodeen, Waadna farxi doontaa, oo waad barwaaqoobi doontaa. 3 Naagtaadu waxay gurigaaga ku dhex ahaan doontaa sida geed canab ah oo midho badan dhala. Carruurtaaduna waxay noqon doonaan sida geedo saytuun ah oo miiskaaga ku wareegsan. 4 Bal eeg, sidaasuu u barakoobi doonaa Ninka Rabbiga ka cabsadaa. 5 Rabbigu Siyoon buu kaa barakayn doonaa, Oo cimrigaaga oo dhan waxaad arki doontaa wanaagga Yeruusaalem. 6 Haah, oo waxaad arki doontaa carruurtaada carruurtooda. Reer binu Israa'iil korkooda nabadu ha ahaato.

**129** Tan iyo yaraantaydii marar badan bay i dhibeen, Reer binu Israa'iil hadda ha yidhaahdeen, 2 Tan iyo yaraantaydii marar badan bay i dhibeen, Laakiinse igama ay adkaan. 3 Kuwa beerta jeexa ayaa dhabarkayga jeexay, Oo jeexjeexoodiina way dheereeyeen. 4 Rabbigu waa xaq, Oo isagu wuxuu kala gooyay xadhkihii kuwa sharka leh. 5 Inta Siyoon neceb oo dhammu, Ha ceeboobeen oo dib ha u noqdeen. 6 Ha noqdeen sida cawska guryaha korkooda ka baxa Oo engega intaanu korin, 7 Oo aan beergooyuhu gacantiisa ka buuxin, Kan xidhmooyinka xidhaana aanu laabtiisa ka buuxin. 8 Oo kuwa ag maraana ma yidhaahdaan, Barakadii Rabbigu korkiinna ha ahaato. Waxaan idiinku ducaynaynaa magaca Rabbiga.

**130** Rabbiyow, waxaan kaaga qayshaday moolalka.
2 Sayidow, codkayga maqal, Oo dhegahaagu ha
noqdeen kuwo u digtoon Codka baryootankayga. 3 Rabbiyow,
haddaad dembiyada u fiirsatid, Bal yaa istaagi doona,
Sayidow? 4 Laakiinse waxaa kula jirta dembidhaafid, In
adiga lagaa cabsado daraaddeed. 5 Waxaan sugaa Rabbiga,
Naftayduna way sugtaa, oo eraygiisa ayaan rajo ku qabaa.
6 Naftaydu waxay Sayidka u dhawrtaa In ka sii badan
sida waardiyuhu u dhawro waaga berigiisa, Haah, in ka
sii badan sida waardiyuhu u dhawro waaga berigiisa. 7
Reer binu Israa'iilow, Rabbiga rajo ku qaba, Waayo, Rabbigu
wuxuu leeyahay naxariis Iyo weliba furasho aad iyo aad u
badan. 8 Oo wuxuu reer binu Israa'iil ka soo furan doonaa
Dembiyadooda oo dhan.

**131** Rabbiyow, qalbigaygu kor isuma qaado,
indhahayguna ma kibirsana, Oo anna iskuma dhex
tuuro axwaal waaweyn, Ama waxyaalihii igu yaab badan. 2
Hubaal naftaydii waan dejiyey, oo waan xasilliyey, Sida
ilmo naas laga gudhiyey oo hooyadiis la jooga, Naftaydu
waxay iigu jirtaa sida ilmo naas laga gudhiyey. 3 Reer binu
Israa'iilow, Rabbiga rajo ku qaba, Haddeer intii laga bilaabo
iyo tan iyo weligiinba.

**132** Rabbiyow, bal xusuuso Daa'uud Dhibaatooyinkiisii
oo dhan, 2 Iyo siduu Rabbiga ugu dhaartay, Oo
nidar ugu galay Ilaaha Xoogga leh oo Yacquub, isagoo leh, 3
Hubaal anigu geli maayo teendhada gurigayga, Sariirtaydana
fuuli maayo, 4 Indhahayga seexasho isugu qaban maayo, Il
iyo baalna isu keeni maayo, 5 Ilaa aan meel u helo Rabbiga,
Oo aan taambuug u helo Kan Xoogga leh oo Yacquub.
6 Bal eeg, annagu waxaan ku maqalnay Efraataah, Oo
waxaan ka helnay berrinkii duurka. 7 Waxaan geli doonnaa
taambuugyadiisa, Oo waxaan ku sujuudi doonnaa meeshuu
cagaha saarto. 8 Rabbiyow, sara joogso, oo meeshaada
nasashada gal, Adiga iyo sanduuqa xooggaaguba. 9
Wadaaddadaadu xaqnimo ha huwadeen, Quduusiintaaduna
farxad ha la qayliyeen. 10 Addoonkaagii Daa'uud daraaddiis
Ha sii jeedin kaaga subkan wejigiisa. 11 Rabbigu run
buu Daa'uud ugu dhaartay, Oo dhaartiisiina ka soo noqon
maayo, Midhaha jidhkaaga midkood ayaan carshigaaga
ku fadhiisin doonaa. 12 Carruurtaadu hadday xajiyaan
axdigayga Iyo markhaatifurkayga aan iyaga bari doono, De
markaas carruurtooduna weligood bay ku fadhiisan doonaan
carshigaaga. 13 Waayo, Rabbigu wuu doortay Siyoon, Oo
wuxuu u jeclaystay inuu rugtiisii ka dhigto. 14 Halkanu waa
meeshaydii nasashada weligeedba, Halkanaan degganaan
doonaa, waayo, waan jeclaystay. 15 Waxaan iyada aad
iyo aad ugu barakayn doonaa quud, Oo masaakiinteeda
waxaan ka dhergin doonaa cunto. 16 Wadaaddadeedana
waxaan huwin doonaa badbaado, Quduusiinteeduna aad
bay ula qaylin doonaan farxad. 17 Halkaas waxaan ka dhigi
doonaa in gees Daa'uud u soo baxo, Waxaan laambad u
diyaariyey kii aan subkaday. 18 Cadaawayaashiisa waxaan
huwin doonaa ceeb, Laakiinse taajkiisu madaxiisuu ku waari
doonaa.

**133** Bal eeg, siday u wanaagsan tahay oo ay u wacan
tahay Inay walaalo wadajir ku degganaadaan! 2 Waa
sida saliidda qaaliga ah ee madaxa, Oo ku soo dareertay
gadhka, Kaasoo ahaa gadhkii Haaruun, Oo waxay soo
gaadhay daraftii dharkiisa, 3 Waana sida dharabka Buur
Xermoon, Oo ku soo dega buuraha Siyoon, Waayo, Rabbigu
wuxuu amray inay halkaas ku dhacdo barako, Taasoo ah
nolosha tan iyo weligeedba.

**134** Bal eega, Rabbiga ammaana, Rabbiga
addoommadiisa oo dhammow, Kuwiinna goor
habeennimo ah guriga Rabbiga dhex taaganow. 2 Gacmaha
u taaga macbudka xaggiisa, Oo Rabbiga ammaana. 3
Rabbigu Siyoon ha idinka soo barakeeyo, Kaasoo ah kii
sameeyey samada iyo dhulkaba.

**135** Rabbiga ammaana. Ammaana magaca Rabbiga,
Rabbiga addoommadiisow, isaga ammaana, 2
Kuwiinna guriga Rabbiga Iyo barxadaha guriga Ilaaheenna
dhex taaganow. 3 Rabbiga ammaana, waayo, Rabbigu
waa wanaagsan yahay, Magiciisa ammaan ugu gabya,
waayo, wuu wacan yahay. 4 Waayo, Rabbigu reer Yacquub
nafsaddiisuu u doortay, Hantidiisa gaarka ah ayuu u doortay
reer binu Israa'iil. 5 Waayo, waan ogahay in Rabbigu weyn
yahay, Iyo in Sayidkeennu ka wada sarreeyo ilaahyada oo
dhan. 6 Rabbigu wax alla wixii uu jeclaystayba wuu ku
sameeyey Samada iyo dhulka, iyo badaha iyo moolalka oo
dhan dhexdooda. 7 Isagaa ka dhiga in dhulka darafyadiisa
uumi ka soo kaco, Roobkana wuxuu u sameeyaa hillaac, Oo
dabayshana isagaa khasnadihiisa ka soo saara. 8 Isagaa
laayay curadyadii Masar, Kuwii dadka iyo kuwii duunyadaba.
9 Masaray, isagu wuxuu dhexdaada u soo diray calaamooyin
iyo yaabab, Oo wax buu ku soo kor daayay Fircoon iyo
addoommadiisii oo dhanba. 10 Wuxuuna laayay quruumo
badan, Oo wuxuu dilay boqorro xoog badan, kuwaas oo
ahaa 11 Siixon oo ahaa boqorkii reer Amor, Iyo Coog oo
ahaa boqorkii Baashaan, Iyo boqortooyooyinkii reer Kancaan
oo dhan, 12 Oo dalkoodiina dhaxal ahaan buu u bixiyey,
Oo wuxuu dhaxal u siiyey dadkiisa reer binu Israa'iil. 13

Rabbiyow, magacaagu weligiisba wuu waaraa, Rabbiyow,
xusuustaadu waxay gaadhaa qarni kasta. 14 Waayo, Rabbigu
dadkiisuu u garsoori doonaa, Oo addoommadiisana wuu u
naxariisan doonaa. 15 Sanamyada quruumuhu waa lacag iyo
dahab, Oo waa wax ay dad gacmaha ku sameeyeen. 16 Afaf
way leeyihiin, laakiinse ma hadlaan, Indhona way leeyihiin,
laakiinse waxba ma arkaan, 17 Dhegona way leeyihiin,
laakiinse waxba ma maqlaan, Oo afkoodana neefu kuma
jirto. 18 Kuwa iyaga sameeyaana sidooda oo kale ayay noqon
doonaan, Iyo xataa mid kasta oo iyaga isku halleeyaaba. 19
Reer binu Israa'iilow, Rabbiga ammaana, Reer Haaruunow,
Rabbiga ammaana, 20 Reer Laawiyow, Rabbiga ammaana,
Kuwiinna Rabbiga ka cabsadow, Rabbiga ammaana. 21
Rabbiga Yeruusaalem deggan ha laga ammaano Siyoon.
Rabbiga ammaana.

**136** Rabbiga ku mahadnaqa, waayo, isagu waa
wanaagsan yahay, Waayo, naxariistiisu weligeedba
way sii waartaa. 2 Ku mahadnaqa Ilaaha ilaahyada, Waayo,
naxariistiisu weligeedba way sii waartaa. 3 Ku mahadnaqa
Sayidka sayidyada, Waayo, naxariistiisu weligeedba way
sii waartaa. 4 Kan keligiis sameeya yaabab waaweyn,
Waayo, naxariistiisu weligeedba way sii waartaa. 5 Kan
samada waxgarashada ku sameeyey, Waayo, naxariistiisu
weligeedba way sii waartaa. 6 Kan dhulka biyaha korkooda
ku goglay, Waayo, naxariistiisu weligeedba way sii waartaa.
7 Kan sameeyey iftiimmo waaweyn, Waayo, naxariistiisu
weligeedba way sii waartaa. 8 Qorraxdu inay maalinta
xukunto, Waayo, naxariistiisu weligeedba way sii waartaa. 9
Dayaxa iyo xiddiguhuna inay habeenka xukumaan, Waayo,
naxariistiisu weligeedba way sii waartaa. 10 Kan Masar
curadyadii ka laayay, Waayo, naxariistiisu weligeedba way
sii waartaa. 11 Oo reer binu Israa'iilna ka soo dhex saaray,
Waayo, naxariistiisu weligeedba way sii waartaa. 12 Kan
kaga soo bixiyey gacan xoog badan iyo cudud fidsan,
Waayo, naxariistiisu weligeedba way sii waartaa. 13 Kan
Badda Cas kala qaybiyey, Waayo, naxariistiisu weligeedba
way sii waartaa. 14 Oo reer binu Israa'iilna dhex marshay
iyada, Waayo, naxariistiisu weligeedba way sii waartaa.
15 Laakiinse Fircoon iyo ciidankiisiiba wuu ku afgembiyey
Badda Cas dhexdeeda, Waayo, naxariistiisu weligeedba
way sii waartaa. 16 Kan dadkiisa cidlada dhex hoggaamiyey,
Waayo, naxariistiisu weligeedba way sii waartaa. 17 Kan
boqorro waaweyn wax ku dhuftay, Waayo, naxariistiisu
weligeedba way sii waartaa. 18 Oo laayay boqorro caan
ah, Waayo, naxariistiisu weligeedba way sii waartaa. 19
Kuwaas oo ahaa Siixon oo ahaa boqorkii reer Amor,
Waayo, naxariistiisu weligeedba way sii waartaa. 20 Iyo
Coog oo ahaa boqorkii Baashaan, Waayo, naxariistiisu
weligeedba way sii waartaa. 21 Oo dalkoodiina u bixiyey
dhaxal ahaan, Waayo, naxariistiisu weligeedba way sii
waartaa. 22 Kaasoo ahaa dhaxalkii uu siiyey addoonkiisii
Israa'iil, Waayo, naxariistiisu weligeedba way sii waartaa.
23 Kan ina soo xusuustay markaan gunta ahayn, Waayo,
naxariistiisu weligeedba way sii waartaa. 24 Oo inaga soo
samatabbixiyey cadaawayaasheennii, Waayo, naxariistiisu
weligeedba way sii waartaa. 25 Kan cunto siiya wax kastoo
jidh leh, Waayo, naxariistiisu weligeedba way sii waartaa.
26 Ku mahadnaqa Ilaaha samada, Waayo, naxariistiisu
weligeedba way sii waartaa.

**137** Waxaannu ag fadhiisannay webiyaashii Baabuloon,
Oo waannu ooynay markii aannu Siyoon soo
xusuusannay. 2 Oo waxaannu kataaradahayagii sudhannay
geedaha safsaafkaa. 3 Waayo, kuwii maxaabiis ahaanta
noo watay ayaa halkaas gabayo nagu weyddiistay, Oo kuwii
na silciyey ayaa farxad na weyddiistay, oo waxay nagu
yidhaahdeen, Noogu gabya gabayadii Siyoon midkood. 4 Bal
sidee baannu gabaygii Rabbiga ugu gabaynaa Dal qalaad
dhexdiis? 5 Yeruusaalemay, haddaan ku illoobo, Gacantayda
midig ha illowdo sancadeedii. 6 Carrabkayguna ha ku
dhego dhanxanagga afkayga, Haddaanan ku xusuusan, Iyo
haddaanan Yeruusaalem ka sii jeclaan Farxaddayda ugu
weyn. 7 Rabbiyow, soo xusuuso reer Edom, Kuwaasoo
maalintii Yeruusaalem yidhi, Dumiya, dumiya, tan iyo
aasaaskeeda. 8 Gabadha Baabuloonay, waa lagu baabbi'in
doonaa, Waxaa faraxsanaan doona kii kaa abaalmariya
Sidii aad nagu samaysay. 9 Waxaa faraxsanaan doona kii
dhallaankaaga qabsada Oo dhagaxa weyn ku dul tuura.

**138** Qalbigayga oo dhan ayaan kugu mahadnaqi doonaa,
Oo ilaahyada hortooda ayaan ammaan kuugu gabyi
doonaa, 2 Waxaan u soo tukan doonaa macbudkaaga
quduuska ah xaggiisa, Oo magacaagana waxaan ugu
mahadnaqi doonaa raxmaddaada iyo runtaada aawadood,
Waayo, eraygaaga ayaad ka sii weynaysay magacaaga oo
dhan. 3 Maalintii aan qayshaday waad ii jawaabtay, Waanad
igu kalsooni gelisay xooggii aad naftayda u yeeshay. 4
Rabbiyow, boqorrada dhulka jooga oo dhammu way kugu
mahadnaqi doonaan, Waayo, waxay maqlaan erayada
afkaaga. 5 Haah, way ka gabyi doonaan jidadka Rabbiga,
Waayo, ammaanta Rabbigu waa weyn tahay. 6 Waayo,
in kastoo Rabbigu sarreeyo, haddana wuu fiiriyaa kuwa
hooseeya, Laakiinse kan kibra meel fog buu ka yaqaan. 7 In
kastoo aan ku dhex socdo dhibaato waad i soo noolayn

doontaa, Oo waxaad gacantaada ku soo fidin doontaa
cadhada cadaawayaashayda, Oo gacantaada midigna way i
badbaadin doontaa. 8 Rabbigaa kaamil ka dhigi doona waxa
igu saabsan, Rabbiyow, naxariistaadu weligeedba way sii
waartaa, Ha ka tegin shuqulladii gacmahaaga.

**139** Rabbiyow, waad i baadhay, oo waad i soo ogaatay.
2 Waad og tahay fadhiisashadayda iyo sara
kiciddaydaba, Oo fikirkaygana meel fog baad ka garataa.
3 Socodkayga iyo seexashadaydaba waad baadhaa, Oo
jidadkayga oo dhanna waad wada taqaan. 4 Waayo,
Rabbiyow, eray aanad aqoonu carrabkayga kuma jiro,
Laakiinse adigu waad wada og tahay. 5 Adigu hor iyo dibba
waad iga xidhay, Oo gacantaadaad i saartay. 6 Aqoontaas
oo kale aad iyo aad bay iigu yaab badan tahay, Waa wax
sare, oo anigu ma aan gaadhi karo. 7 Bal xaggee baan
ruuxaaga ka tagaa? Xaggee baanse wejigaaga uga cararaa?
8 Haddaan samada koro, halkaasaad joogtaa, Haddaan
sariirtayda She'ool dhex dhigtona, bal eeg, halkaasna waad
joogtaa. **(Sheol h7585)** 9 Haddaan qaato baalasha subaxda,
Iyo haddaan dego badda darafyadeeda ugu shisheeyaba,
10 Xataa halkaas gacantaada ayaa i hoggaamin doonta,
Oo midigtaada ayaa i soo qaban doonta. 11 Haddaan
idhaahdo, Hubaal gudcurkaa i qarin doona, Oo iftiinka
igu wareegsanu habeennimuu noqon doonaa, 12 Xataa
gudcurku igama kaa qariyo, Laakiinse habeenku wuxuu u
iftiimaa sida maalinta oo kale, Gudcurka iyo iftiinku waa
isugu kaa mid. 13 Waayo, kelyahayga adigaa sameeyey,
Oo adigaa igu daboolay maxalkii hooyaday. 14 Waan kugu
mahadnaqi doonaa, waayo, waxaa la ii sameeyey si cabsi
iyo yaab badan, Shuqulladaadu waa yaab badan yihiin,
Oo naftayduna taas aad bay u taqaan. 15 Lafahaygu
kaama qarsoonayn, Markii laygu sameeyey qarsoodiga, Oo
farsamada yaabka leh laygu sameeyey dhulka meesha ugu
hoosaysa. 16 Indhahaagu way i arkeen markaan uurjiifka
ahaa, Oo xubnahaygu kitaabkaagay ku wada qornaayeen,
Kuwaas oo maalin ka maalin la qabanqaabiyey Intaan
midkoodna jirin ka hor. 17 Ilaahow, fikirradaadu ila qiimo
badanaa! Oo tiro badanaa! 18 Haddaan tiriyo, way ka sii
tiro badan yihiin ciidda, Oo markaan tooso weli adigaan
kula joogaa. 19 Ilaahow, hubaal waxaad layn doontaa kuwa
sharka leh, Haddaba iga taga, raggiinna dhiigyocabyada
ahow. 20 Waayo, iyagu si xun ayay wax kaaga sheegaan,
Oo cadaawayaashaaduna micnela'aan bay magacaaga ku
soo qaadqaadaan. 21 Rabbiyow, sow ma aan nebci kuwa ku
neceb? Oo sow kama aan murugaysni kuwa kugu kaca?
22 Nacayb dhan ayaan ku necbahay iyaga, Oo waxaan
iyaga u haystaa cadaawayaashayda. 23 Ilaahow, i baadh, oo
qalbigayga garo, I tijaabi, oo fikirradayda ogow, 24 Oo bal
fiiri inuu jid xumaan ahu igu jiro iyo in kale, Oo igu hoggaami
jidka weligiis ah.

**140** Rabbiyow, ninka sharka leh iga samatabbixi, Oo iga
ilaali ninka dulmiga badan, 2 Kuwaasoo qalbigooda
kaga fikira belaayooyin, Had iyo goorna dagaal bay isu
soo urursadaan. 3 Waxay carrabkoodii u afaysteen sidii
abeeso oo kale, Oo bushimahoodana waxaa ku hoos jirta
waabaydii jilbiska. (Selaah) 4 Rabbiyow, gacmaha kuwa
sharka leh iga dhawr, Oo iga ilaali ninka dulmiga badan,
Kuwaasoo u qasdiyey inay tallaabooyinkayga dhinac u
leexiyaan. 5 Kuwa kibirka badanu waxay ii qariyeen dabin
iyo xadhko, Oo jidka dhinaciisana waxay ii gogleen shabag,
oo siriq bay ii qooleen. (Selaah) 6 Waxaan Rabbiga ku
idhi, Waxaad tahay Ilaahayga, Haddaba, Rabbiyow, bal
dhegta u dhig codka baryootankayga. 7 Ilaahow Sayidow,
xooggii badbaadadaydow, Maalintii dagaalka madaxaygaad
dabooshay. 8 Rabbiyow, kuwa sharka leh ha siin waxay
doonayaan, Oo horay ha u sii wadin xeeladdooda sharka ah,
waaba intaasoo ay kor isu qaadaane. (Selaah) 9 Oo kuwa
igu wareegsan madaxoodana Belaayada bushimahooda ka
soo baxaysa ha daboosho. 10 Dhuxulo ololaya ha ku soo dul
daateen, Oo iyaga ha lagu dhex tuuro dabka, Iyo godad aad
u dhaadheer, si aanay mar dambe u soo sara kicin. 11 Ninka
sharka ku hadlaa yaanu dhulka ku sii waarin, Sharku wuxuu
u ugaadhsan doonaa ninka dulmiga badan inuu afgembiyo
aawadeed. 12 Waan ogahay in Rabbigu kuwa dhibban
dacwadooda u gar qaadi doono, Oo uu kuwa baahanna
xaqooda siin doono. 13 Hubaal kuwa xaqa ahu waxay ku
mahadnaqi doonaan magacaaga, Oo kuwa qummanuna
waxay joogi doonaan hortaada.

**141** Rabbiyow, adigaan kuu qayshaday, haddaba ii soo
dhaqso, Oo markaan kuu qayshado, codkayga
dhegta u dhig. 2 Baryootankaygu ha noqdo sida foox
hortaada la dhigay, Oo gacma-koruqaadiddayduna ha noqoto
sida allabariga fiidnimo. 3 Rabbiyow, afkayga waardiye hor
jooji, Oo albaabka bushimahaygana dhawr. 4 Qalbigayga
ha u duwin wax shar ah, Yaanu falimo xumaan ah la gelin
Dadka xumaanta ka shaqeeya, Oo yaanan wax ka cunin
waxyaalahooda macaan. 5 Kan xaqa ahu ha i dilo, raxmad
bay ii ahaan doontaa, Oo ha i canaanto, waxay ii noqon
doontaa sida saliid madaxa lagu shubto, Madaxayguna yaanu
diidin, Waayo, xataa intay sharkooda ku sii jiraan ayaan
tukashadayda ka geesta ah sii wadaa. 6 Xaakinnadoodii
waxaa lagu tuuray dhagaxa dhinacyadiisa, Oo iyagu waxay

maqli doonaan erayadayda, waayo, way macaan yihiin.
7 Sida markii beerta la qodo oo dhulka la jeexo Ayaa
lafahayagii ugu firidhsan yihiin She'ool afkiisa. (Sheol h7585) 8
Waayo, Ilaahow Sayidow, indhahaygu xaggaagay ku soo jeedaan, Oo adigaan isku kaa halleeyaa, haddaba naftayda ha dayrin.
9 Iga dhawr dabinka ay ii dhigeen, Iyo siriqda ay xumaanfalayaashu qooleen.
10 Kuwa sharka lahu ha ku dhex dheceen shabagyadooda Markaan anigu ka baxsado.

**142** Anigu codkaygaan Rabbiga ugu qayshadaa, Oo codkaygaan Rabbiga ku baryaa.
2 Oo hortiisaan ku cawdaa, Oo dhibaatadaydana hortiisaan ku muujiyaa.
3
Markii naftaydu gudahayga ku itaal darnaatay, waddadayda waad tiqiin, Jidka aan ku socdona dabin bay iigu qariyeen.
4
Bal fiiri xaggayga midig, oo bal arag, Waayo, nin i yaqaan ma jiro, Meel aan magangalo ayaan waayay, ninna naftayda dan kama leh.
5 Rabbiyow, adigaan kuu qayshaday, Oo waxaan idhi, Waxaad tahay magangalkayga, Iyo qaybta aan dalka kuwa nool ku leeyahay.
6 Qayladayda dhegayso, waayo, aad baa hoos laygu dejiyey, Kuwa i silciya iga samatabbixi, waayo, iyagu way iga xoog badan yihiin.
7 Naftayda xabsiga ka soo bixi, si aan magacaaga ugu mahadnaqo, Kuwa xaqa ah ayaa igu hareeraysnaan doona, Waayo, wax badan oo wanaagsan baad ii samayn doontaa.

**143** Rabbiyow, tukashadayda maqal, oo baryootankayga dhegta u dhig, Oo daacadnimadaada iyo xaqnimadaada iigu jawaab.
2 Anoo addoonkaaga ah xukun ha i gelin, Waayo, inta nool oo dhan ma jiro nin hortaada lagu caddayn doonaa inuu xaq yahay.
3 Waayo, cadowgaa naftayda silciyey, Noloshaydiina dhulkuu ku tuuray, Oo wuxuu iga dhigay inaan meelo gudcur ah dego, sidii kuwii waagii hore dhintay.
4 Sidaas daraaddeed ayaa ruuxaygu iigu dhex itaal darnaadaa, Qalbigayguna gudahayguu ku cidloobay.
5 Waxaan soo xusuustaa wakhtigii hore, Falimahaaga oo dhanna waan ka fikiraa, Oo waxaan fiiro u yeeshaa shuqulkii gacmahaaga.
6 Gacmahaygaan kuu hoorsadaa, Oo naftaydu adigay kuu harraaddaa sida dhul oommane ah. (Selaah) 7
Rabbiyow, dhaqso iigu soo jawaab, waayo, naftaydu way itaal darnaataa. Wejigaaga ha iga qarin, Waaba intaasoo aan noqdaa sida kuwa godka ku dhaca oo kale.
8 Aroorta naxariistaada i maqashii, Waayo, adigaan isku kaa halleeyaa, I garansii sidii aan u socon lahaa, Waayo, naftaydaan kor kuugu qaadaa.
9 Rabbiyow, cadaawayaashayda iga samatabbixi, Waayo, adaan kugu soo cararaa inaad i qariso.
10 I bar si aan doonistaada u sameeyo, waayo, waxaad tahay Ilaahayga, Ruuxaaga wanaagsanu ha igu dhex hoggaamiyo dalka qummanaanta.
11 Rabbiyow, ii soo noolee magacaaga daraaddiis, Oo xaqnimadaada naftayda kaga soo bixi dhibaato.
12 Oo raxmaddaada cadaawayaashayda ku wada tirtir, Kuwa naftayda dhiba oo dhanna baabbi'i, Waayo, waxaan ahay addoonkaaga.

**144** Mahad waxaa leh Rabbiga dhagaxayga weyn ah, Oo gacmahayga dagaalka bara, Farahaygana dirirta bara,
2 Kaasoo ah raxmaddayda, iyo qalcaddayda, Munaaraddayda, iyo samatabbixiyahayga, Iyo gaashaankayga, iyo kan aan isku halleeyo, Oo dadkayga ka yeela kuwo iga hooseeya.
3 Rabbiyow, waa maxay dadku oo aad u xusuusataa isaga? Ama wiilka aadanaha oo aad ka fikirtaa isaga?
4 Dadku waa sida wax aan waxtar lahayn, Oo cimrigiisuna waa sida hooska libdha.
5 Rabbiyow, samooyinkaaga foorori, oo soo dhaadhac, Buuraha taabo, oo iyana way qiiqi doonaan.
6 Hillaac soo tuur, oo iyaga kala firdhi, Fallaadhahaaga soo gan, oo iyaga jebi.
7 Gacantaada kor ka soo fidi, Oo i badbaadi, oo iga samatabbixi biyaha badan, Iyo gacanta shisheeyayaasha,
8
Kuwaasoo afkoodu wax bilaash ah ku hadlo, Gacantooda midigna tahay midig beeneed.
9 Ilaahow, gabay cusub ayaan kuugu gabyi doonaa, Oo waxaan ammaan kuugu gabyi doonaa shareerad toban xadhig leh.
10 Waa isaga kan boqorrada badbaadiyaa, Oo addoonkiisa Daa'uud ka badbaadiya seefta sharka leh.
11 I badbaadi, oo iga samatabbixi gacanta shisheeyayaasha, Kuwaasoo afkoodu wax bilaash ah ku hadlo, Gacantooda midigna tahay midig beeneed.
12 Markii wiilashayadu ay noqdaan sidii geedo yaraantoodii ku koray, Oo gabdhahayaguna ay noqdaan sidii dhagaxyada rukunka oo loo qoray qaabkii guriga boqorka,
13 Markii maqsinnadayadu ay buuxsamaan iyagoo na siinaya alaab cayn kasta ah, Idahayaguna ay noo dhalaan kumanyaal iyo kumaankun oo berrimmada noo jooga,
14 Markii dibidayadu ay aad u xoogaystaan, Markaan la arag weerarid iyo qaxid, Oo aan cabasho jirin jidadkayaga dhexdooda,
15 Waxaa faraxsan dadkii xaalkoodu sidaas yahay, Haah, oo waxaa faraxsan dadkii Rabbigu Ilaahooda yahay.

**145** Ilaahayow, Boqorow, anigu waan ku sarraysiin doonaa, Oo magacaagana waan ammaani doonaa weligay iyo weligayba.
2 Maalin kasta mahad baan kuu naqi doonaa, Oo magacaagana waan ammaani doonaa weligay iyo weligayba.
3 Rabbigu waa weyn yahay, oo waa in aad loo ammaano, Weynaantiisuna waa mid aan la baadhi karin.
4 Farcanba farcan ayuu shuqulladaada u ammaani doonaa, Oo waxay ka warrami doonaan falimahaaga waaweyn.
5 Anigu waxaan ka fikiri doonaa

haybadda ammaanta leh oo sharaftaada, Iyo shuqulladaada
yaabka badan. 6 Dadku waxay ka hadli doonaan xooggii
falimahaaga cabsida badan, Oo anna waxaan sheegi doonaa
weynaantaada. 7 Waxay ku hadli doonaan wanaaggaaga
badan xusuustiisa, Xaqnimadaadana way ka gabyi doonaan.
8 Rabbigu waa nimco miidhan, oo waxaa ka buuxda raxmad,
Cadhona wuu u gaabiyaa, wuuna naxariis badan yahay.
9 Rabbigu wax kasta wuu u roon yahay, Naxariistiisuna
waxay ka sarraysaa shuqulladiisa oo dhan. 10 Rabbiyow,
shuqulladaada oo dhammu way kugu mahadnaqi doonaan,
Oo quduusiintaaduna way ku ammaani doonaan. 11
Waxay ka hadli doonaan sharafta boqortooyadaada, Oo
waxay ka sheekaysan doonaan xooggaaga, 12 Si ay binu-
aadmiga u ogeysiiyaan Ilaah falimihiisa waaweyn, Iyo
ammaanta haybadda boqortooyadiisa. 13 Boqortooyadaadu
waa boqortooyo daa'imis ah, Oo dawladnimadaaduna way
sii waartaa tan iyo ab ka ab. 14 Rabbigu wuu tiiriyaa
kuwa kufa oo dhan, Oo wuxuu toosiyaa kuwa gota oo
dhan. 15 Wax kasta indhahoodu adigay wax kaa sugayaan,
Oo quudkoodana waad siisa xilligiisa. 16 Gacantaadaad
furtaa, Oo waxaad dherjisaa wax kasta oo nool. 17 Rabbigu
jidadkiisa oo dhan wuu ku qumman yahay, Oo shuqulladiisa
oo dhanna wuu ku nimco badan yahay. 18 Rabbigu waa u
dhow yahay inta isaga barida oo dhan, Kuwaas oo ah inta
runta ku barida oo dhan. 19 Kuwa isaga ka cabsada waxay
doonayaanba wuu siin doonaa, Oo weliba qayladoodana
wuu maqli doonaa, wuuna badbaadin doonaa iyaga. 20
Rabbigu inta isaga jecel oo dhan wuu ilaaliyaa, Laakiinse
kuwa sharka leh oo dhan wuu wada baabbi'in doonaa.
21 Afkaygu wuxuu ku hadli doonaa ammaanta Rabbiga,
Oo inta jidh leh oo dhammuna magiciisa quduuska ah ha
ammaaneen weligood iyo weligoodba.

**146** Rabbiga ammaana. Naftaydoy, Rabbiga ammaan.
2 Intaan noolahay oo dhan Rabbiga waan ammaani
doonaa, Oo ammaan baan Ilaahay ugu gabyi doonaa
intaan jiro oo dhan. 3 Ha isku hallaynina amiirrada Iyo
binu-aadmiga aan waxba caawimi karin. 4 Naftiisu way ka
baxdaa, oo wuxuu ku noqdaa dhulkiisii. Oo isla maalintaas
ayaa fikirradiisu baabba'aan. 5 Waxaa faraxsan ninkii ay
caawimaaddiisu tahay Ilaaha reer Yacquub, Oo rajadiisuna ay
ku xidhan tahay Rabbiga Ilaahiisa ah, 6 Oo sameeyey cirka
iyo dhulka, Iyo badda iyo waxyaalaha ku jira oo dhan, Oo
runtana dhawra weligiisba, 7 Oo kuwa la dulmay u garsoora,
Oo kuwa gaajaysanna quud siiya. Rabbigu maxaabiistuu
furaa. 8 Rabbigu indhahuu u bixiyaa indhoolayaasha, Oo
kuwa gotana Rabbigaa toosiya, Oo kuwa xaqa ahna Rabbigu
waa jecel yahay. 9 Rabbigu waa ilaaliyaa kuwa qariibka ah,
Oo isagaa taageera agoonta iyo carmallada, Laakiinse jidka
kuwa sharka leh wuu qalloociyaa. 10 Rabbigu xukun buu
haysan doonaa weligiis, Siyoonay, Ilaahaagaa boqor ah tan
iyo ab ka ab. Rabbiga ammaana.

**147** Rabbiga ammaana. Waayo, way wanaagsan tahay
in Ilaaheenna ammaan loogu gabyo, Waayo, taasu
way wacan tahay, oo ammaantuna way habboon tahay. 2
Rabbigu Yeruusaalem buu dhisaa, Oo wuxuu isu soo wada
ururiyaa kuwa la naco oo reer binu Israa'iil ah. 3 Isagaa
bogsiiya kuwa qalbi jabay, Oo nabrahoodana wuu duubaa.
4 Wuxuu sheegaa xiddigaha tiradooda, Oo kulligoodna
magacyo buu u bixiyaa. 5 Sayidkeennu waa weyn yahay,
wuuna xoog badan yahay, Waxgarashadiisuna waa mid aan
la koobi karayn. 6 Rabbigu wuu tiiriyaa kuwa camalka qabow,
Oo kuwa sharka lehna dhulkuu ku soo tuuraa. 7 Rabbiga
mahadnaqid ugu gabya, Oo kataaradda ammaan ugu gabya
Ilaaheenna, 8 Kaasoo samada daruuro ku qariya, Oo dhulka
roob u diyaarsha, Buurahana doog ka soo bixiya. 9 Wuxuu
quud siiyaa xayawaanka, Iyo tukayaasha yaryar markay
qayliyaanba. 10 Isagu kuma farxo xoogga faraska, Oo kuma
reyreeyo lugaha dadka. 11 Rabbigu wuxuu ku reyreeyaa
kuwa isaga ka cabsada, Iyo kuwa naxariistiisa rajada ka
qaba. 12 Yeruusaalemay, Rabbiga ammaan, Siyoonay,
Ilaahaaga ammaan. 13 Waayo, wuxuu xoogeeyey qataarrada
irdahaaga, Carruurtaadana wuu kugu dhex barakeeyey.
14 Soohdimahaaga nabad buu ka dhigaa, Oo wuxuu kaa
dhergiyaa sarreenka ugu wanaagsan. 15 Amarkiisa wuxuu
u soo diraa dhulka, Eraygiisuna aad buu u dheereeyaa.
16 Baraf cad wuxuu u soo daadshaa sida dhogor oo kale,
Sayax barafoobayna wuxuu u kala firdhiyaa sida dambas
oo kale. 17 Barafkiisa wuxuu u soo ridaa sida jajab oo
kale, Bal yaa qabowgiisa hor istaagi kara? 18 Wuxuu soo
diraa eraygiisa, oo wuu dhalaaliyaa iyaga, Dabayshiisana
wuxuu ka dhigaa inay dhacdo, biyuhuna way qulqulaan. 19
Eraygiisa wuxuu tusaa reer Yacquub, Qaynuunnadiisa iyo
xukummadiisana reer binu Israa'iil. 20 Quruunna sidaas oo
kale uma uu samayn. Xukummadiisiina ma ay garanaynin,
Rabbiga ammaana.

**148** Rabbiga ammaana. Rabbiga samooyinka ka
ammaana, Meelaha sarsarena ka ammaana. 2
Malaa'igihiisa oo dhammow, ammaana isaga, Ciidankiisa
oo dhammow, ammaana isaga. 3 Qorraxda iyo dayaxow,
ammaana isaga, Xiddigaha iftiinka oo dhammow, ammaana
isaga. 4 Ammaana isaga, samooyinka samooyinkow, Iyo
biyaha samooyinka ka sarreeyow. 5 Iyagu magaca Rabbiga

ha ammaaneen, Waayo, isagu wuu amray, oo iyana way
abuurmeen. 6 Oo weliba isagaa adkeeyey iyaga weligood
iyo weligoodba, Oo wuxuu sameeyey xad aan la gudbi
doonayn. 7 Rabbiga dhulka ka ammaana, Masbadeedyo
iyo moolal oo dhammow, 8 Dab iyo roobdhagaxyaale,
baraf cad iyo ceeryaamow, Iyo dabayl duufaan ah oo
eraygiisa oofiyow, 9 Buuro iyo kuro oo dhammow, Dhir
midho badan iyo dhir kedar la yidhaahdo oo dhammow,
10 Dugaag iyo xoolo oo dhammow, Waxa gurguurta iyo
haadda duusha oo dhammow, 11 Boqorrada dhulka iyo
dadyowga oo dhammow, Amiirrada iyo xaakinnada dhulka
oo dhammow, 12 Barbaar iyo hablow, Odayaal iyo carruuray,
13 Ha ammaaneen magaca Rabbiga, Waayo, magiciisa oo
keliya ayaa la sarraysiiyaa, Ammaantiisu dhulka iyo cirkaba
way ka korraysaa. 14 Isagu wuxuu sare u qaaday geeskii
dadkiisa, Iyo ammaantii quduusiintiisa oo dhan, Waana reer
binu Israa'iil oo ah dad isaga u dhow. Rabbiga ammaana.

**149** Rabbiga ammaana. Rabbiga gabay cusub ugu
gabya, Oo ammaantiisana shirka quduusiinta kaga
dhex gabya. 2 Reer binu Israa'iil kii iyaga uumay ha ku
reyreeyeen, Oo reer Siyoonna boqorkooda ha ku farxeen. 3
Magiciisa cayaarta ha ku ammaaneen, Oo ammaan ha ugu
gabyeen iyagoo sita daf iyo kataarad. 4 Waayo, Rabbigu
wuxuu ku farxaa dadkiisa, Wuxuu kuwa camalka qabowna
ku qurxin doonaa badbaado. 5 Quduusiintu ammaan ha ku
reyreeyeen, Oo farxad ha ku gabyeen iyagoo sariirahooda
jiifa. 6 Ammaanta sare oo Ilaah afkooda ha ku jirto, Seef
laba af lahuna gacantooda ha ku jirto, 7 Si ay quruumaha
uga aargutaan, Oo ay dadyowgana u ciqaabaan, 8 Si ay
boqorradooda silsilado ugu soo xidhaan, Oo ay raggooda
gobta ahna jeebbooyin bir ah ugu soo xidhaan, 9 Si ay
iyaga ugu soo dejiyaan xukunka qoran, Quduusiintiisa oo
dhammuna waxay leeyihiin sharaftan. Rabbiga ammaana.

**150** Rabbiga ammaana. Ilaah ku dhex ammaana
meeshiisa quduuska ah, Ku dhex ammaana samada
xooggiisa. 2 Falimihiisa waaweyn aawadood u ammaana, U
ammaana si waafaqsan weynaantiisa sare. 3 Dhawaaqa
buunka ku ammaana, Oo shareerad iyo kataarad ku
ammaana. 4 Ku ammaana daf iyo cayaar, Oo ku ammaana
alaab xadhko leh oo muusiko ah iyo biibiile. 5 Suxuunta
laysku garaaco oo codka dheer ku ammaana, Ku ammaana
suxuunta sanqadha dheer. 6 Wax kasta oo neef lahuba
Rabbiga ha ammaaneen. Rabbiga ammaana.

# Maahmaahyadii

1 Kuwanu waa maahmaahyadii Sulaymaan ina Daa'uud
oo ahaa boqorkii reer Binu Israa'iil, 2 Wuxuu u qoray si
loo ogaado xigmadda iyo edbinta, Oo loo garto erayada
waxgarashada, 3 In la helo edbinta ku saabsan xigmadda,
Iyo xaqnimada iyo garta iyo caaddilnimada; 4 Si miyir
loo siiyo garaadlaawaha, Oo aqoon iyo digtoonaanna loo
yeelo ninka dhallinyarada ah. 5 Ninkii caqli lahu wuu maqli
doonaa, oo wuxuu korodhsan doonaa waxbarasho, Oo ninkii
garaad lahuna wuxuu qabsan doonaa talada wanaagsan, 6
Si lagu garto maahmaahda, iyo micnaynta, Iyo hadallada
kuwa caqliga leh iyo xujooyinkooda. 7 Waxaa aqoonta ugu
horreeya Rabbiga ka cabsashadiisa; Laakiinse nacasyadu
waxay quudhsadaan xigmadda iyo edbinta. 8 Wiilkaygiiyow,
edbinta aabbahaa maqal, Oo amarka hooyadaana ha ka
tegin, 9 Waayo, waxay madaxaaga u noqon doonaan
wax sharraxsan, Oo waxay kuu noqon doonaan silsilado
qoorta kuu sudhan. 10 Wiilkaygiiyow, haddii dembilayaal ku
sasabtaan, Ha oggolaan. 11 Hadday kugu yidhaahdaan,
Na soo raac, Aan gaadno inaynu dhiig daadinno, Oo
aynu sababla'aan kuwa aan eedda lahayn si qarsoon ugu
dhuumanno; 12 Oo iyagoo nool aynu u liqno sida qabriga oo
kale, Dhammaantoodna aan juq siinno sida kuwa yamayska
ku dhaca; **(Sheol h7585)** 13 Waxaynu heli doonnaa maal
qaali ah oo cayn kasta ah, Oo guryaheennana waxaynu ka
buuxsan doonnaa booli; 14 Nasiibkaaga iskula kaaya soo
dar, Oo kulligeenna aynu kiishad qudha wada lahaanno;
15 Wiilkaygiiyow, iyaga jidka ha la marin; Oo cagtaadana
wadiiqadooda dib uga jooji; 16 Waayo, cagahoodu waxay u
ordaan shar, Oo waxay u degdegaan inay dhiig daadiyaan.
17 Waayo, waa waxtarla'aan dabinka loo dhigaa Iyadoo ay
shimbirtu u jeeddo; 18 Iyagu waxay u gaadaan si dhiiggooda
loo daadiyo, Oo waxay si qarsoon ugu dhuuntaan si naftooda
looga qaado. 19 Sidaas oo kalay yihiin jidadka mid kasta
oo faa'iido u hunguri weyn, Oo nafta ka qaada kuwa leh.
20 Xigmaddu aad bay uga qaylisaa jidka; Oo codkeedana
waxay kor uga qaaddaa bannaanka; 21 Waxay ka qaylisaa
meesha suuqa ugu weyn; Oo iridda magaalada laga soo galo
Ayay erayadeeda kaga hadashaa, iyadoo leh, 22 Kuwiinna
garaadlaawayaasha ahow, ilaa goormaad garaadla'aanta sii
jeclaanaysaan? Oo kuwa wax quudhsadaana, ilaa goormay
quudhsashadooda ku sii farxayaan? Nacasyaduna, ilaa
goormay aqoonta sii necbaanayaan? 23 Canaantayda u
soo noqda; Bal eega, anigu waxaan idinku shubi doonaa
ruuxayga, Oo waxaan idin ogeysiin doonaa erayadayda. 24
Anigu waan idiin yeedhay, laakiinse waad i diiddeen; Oo anigu
gacantaydaan soo fidiyey, oo ninnana dan kama yeelan; 25
Laakiinse idinku taladaydii oo dhan waad fududaysateen, Oo
canaantaydiina ma aydin doonaynin; 26 Sidaas daraaddeed
aniguna waan idinku qosli doonaa markay belaayo idinku
dhacdo; Waanan idinku majaajiloon doonaa markay cabsiyu
idinku soo degto; 27 Markay cabsidiinnu u timaado sida
duufaan oo kale, Oo belaayadiinnuna u timaado sida
dabayl cirwareen ah; Oo dhibaato iyo cidhiidhi idinku
yimaadaan. 28 Markaasay ii yeedhan doonaan, laakiinse
anigu uma aan jawaabi doono; Oo horay ii doondooni
doonaan, laakiinse ima ay heli doonaan; 29 Waayo, waxay
nebcaadeen aqoonta, Oo Rabbiga ka cabsashadiisana ma
ay dooran; 30 Iyagu taladaydii innaba ma ay doonaynin; Oo
canaantaydii oo dhanna way quudhsadeen; 31 Haddaba
iyagu waxay cuni doonaan midhihii jidkooda, Oo waxay ka
dhergi doonaan taladoodii. 32 Waayo, garaadlaawayaasha
dibunoqoshadooda ayaa iyaga dili doonta, Oo nacasyadana
waxaa baabbi'in doonta barwaaqadooda. 33 Laakiinse ku alla
kii aniga i maqlaa, ammaan buu u fadhiyi doonaa, Wuuna
xasilloonaan doonaa, isagoo aan shar ka cabsanaynin.

2 Wiilkaygiiyow, haddaad erayadayda aqbashid, Oo aad
amarradayda qalbigaaga ku haysatid, 2 Si aad dhegta
xigmadda ugu dhigtid, Oo aad qalbigaagana waxgarashada
ugu qabatid; 3 Haddaad wax-kala-garashada ka daba
qaylisid, Oo aad codkaaga waxgarashada kor ugu qaaddid;
4 Haddaad iyada u raadisid sida lacagta oo kale, Oo aad u
doondoontid sida maal qarsoon, 5 Markaas waxaad garan
doontaa Rabbiga ka cabsashadiisa, Oo waxaad heli doontaa
aqoonta Ilaah. 6 Waayo, Rabbigu isagaa bixiya xigmadda,
Oo afkiisa waxaa ka soo baxa aqoonta iyo waxgarashada.
7 Isagu kuwa xaqa ah xigmad buu u kaydiyaa, Oo kuwa
daacadnimada u socdana waa u gaashaan. 8 Isagu wuxuu
dhawraa waddooyinka garta, Oo wuxuu xannaaneeyaa jidka
quduusiintiisa. 9 Markaasaad garan doontaa xaqnimada,
iyo garta, Iyo caaddilnimada, iyo jid kasta oo wanaagsan.
10 Waayo, waxaa qalbigaaga soo geli doonta xigmadda,
Oo aqoontuna waxay ka farxin doontaa naftaada; 11
Digtoonaanta baa ku xanaanayn doonta, Oo waxaa ku
dhawri doonta waxgarashada, 12 Si lagaaga samatabbixiyo
jidka kan sharka ah, Iyo dadka waxyaalaha qalloocan ku
hadla, 13 Oo qummanaanta waddooyinkeeda ka taga, Si ay
jidadka gudcurka ugu socdaan, 14 Oo ay ku reyreeyaan inay
xumaan falaan, Oo ay qalloocnaanta kan sharkaa ku farxaan;
15 Oo jidadkoodu maroorsan yihiin, Oo waddooyinkooduna
qalloocan yihiin, 16 In lagaa samatabbixiyo naagta qalaad,
Xataa naagta qalaad oo hadalladeeda kugu sasabata,

17 Taasoo ka tagta horseedkii yaraanteeda, Oo illowda
axdigii Ilaaheeda; 18 Waayo, gurigeedu wuxuu ku foorolook
dhimasho, Oo waddooyinkeeduna waxay ku dhaadhacaan
kuwii dhintay. 19 Kuwa iyada u gala midkoodna sooma
noqdo, Oo waddooyinka noloshana ma ay helaan. 20 Waa
inaad ku socotid jidka dadka wanaagsan, Oo aad dhawrtid
waddooyinka kuwa xaqa ah. 21 Waayo, kuwa qummanu
dhulkay fadhiyi doonaan, Oo kuwa kaamilka ahuna way sii
joogi doonaan. 22 Laakiinse kuwa sharkaa waa laga gooyn
doonaa dhulka, Oo khaayinnadana waa laga rujin doonaa.

3 Wiilkaygiiyow, waxbariddayda ha illoobin, Laakiin
qalbigaagu amarradayda ha hayo, 2 Waayo, iyagu
waxay kuu kordhin doonaan Maalmo badan iyo cimri
dheer iyo nabad. 3 Naxariista iyo runtu yaanay kaa tegin,
Iyaga qoorta ku xidh, Oo looxa qalbigaaga ku qor, 4
Sidaasaad Ilaah iyo dadka hortooda Nicmo iyo sharaf uga
heli doontaa. 5 Qalbigaaga dhammaantii Rabbiga ku aamin,
Oo waxgarashadaadana ha isku hallayn. 6 Jidadkaaga
oo dhan isaga ku qiro, Oo isna waddooyinkaaguu toosin
doonaa. 7 Ha isla weynaan; Rabbiga ka cabso; oo sharka
ka fogow. 8 Taasu waxay xundhurtaada u noqon doontaa
caafimaad, Oo lafahaagana waxay u noqon doontaa dhuux.
9 Rabbiga ku murwee maalkaaga Iyo midhaha ugu horreeya
waxa kuu kordha oo dhan; 10 Sidaasay maqsinnadaadu
barwaaqo uga buuxsami doonaan, Macsarooyinkaaguna
waxay la buuxdhaafi doonaan khamri cusub. 11 Wiilkaygiiyow,
Rabbiga edbintiisa ha quudhsan, Oo canaantiisana ha
ka daalin, 12 Waayo, Rabbigu ninkuu jecel yahay wuu
canaantaa Sida aabbe u canaanto wiilkii uu ku faraxsan
yahay. 13 Waxaa barakaysan ninkii xigmadda hela, Iyo ninkii
waxgarashada mulkiya. 14 Waayo, baayacmushtarigeedu
waa ka sii wanaagsan yahay baayacmushtariga lacagta, Oo
faa'iidadeeduna waa ka sii wanaagsan tahay dahabka saafiga
ah. 15 Way ka sii qaalisan tahay luulka, Oo waxaad jeclaan
kartid oo dhanna iyada lalama simo. 16 Gacanteeda midig
waxaa ku jira cimri dheeri; Gacanteeda bidixna waxaa ku jira
hodonnimo iyo sharaf. 17 Jidadkeedu waa jidad farxadeed,
Oo waddooyinkeeda oo dhammuna waa nabad. 18 Kuwii
iyada qabsada waxay u tahay geed nololeed; Oo waxaa
barakaysan ku alla kii iyada xajista. 19 Rabbigu wuxuu dhulka
ku aasaasay xigmadda, Oo samooyinkana wuxuu ku dhisay
waxgarashada. 20 Aqoontiisa ayaa moolalku ku dillaaceen,
Oo cirkuna wuxuu soo daadiyaa sayax. 21 Wiilkaygiiyow,
waxyaalahanu yaanay indhahaaga ka tegin. Xigmadda iyo
digtoonaanta xajiso. 22 Sidaasay naftaada nolol ugu noqon
doonaan, Qoortaadana nimco. 23 Markaasaad jidkaaga
ammaan ku mari doontaa, Oo cagtaaduna ma turunturoon
doonto. 24 Markaad jiifsatidna ma cabsan doontid; Haah,
waad jiifsan doontaa, oo hurdadaaduna way kuu macaanaan
doontaa. 25 Ha ka baqin cabsi kedis ah, Iyo baabbi'inta kuwa
sharka leh toona markii ay timaado. 26 Waayo, Rabbigu
wuxuu kuu ahaan doonaa Kan aad ku kalsoonaan karto.
Oo cagtaadana wuu dhawri doonaa si aan loo qabsan.
27 Wanaag ha u diidin kuwa uu ku habboon yahay in loo
sameeyo, Markaad awood u leedahay inaad u samayso. 28
Deriskaaga ha ku odhan, Tag oo soo noqo, Berri baan ku
siin doonaaye, Haddii aad markaas haysid. 29 Deriskaaga
innaba xumaan ha u fikirin, Maxaa yeelay, isagu nabadgelyo
buu kuu ag fadhiyaa. 30 Ninna sababla'aan ha kula diririn,
Haddaanu xumaan kugu samayn. 31 Ha ka hinaasin nin
dadka dulmiya, Oo jidadkiisana midnaba ha dooran. 32
Maxaa yeelay, kuwa qalloocanu waa u karaahiyo Rabbiga,
Laakiinse wuxuu sir la leeyahay kuwa qumman. 33 Rabbigu
wuxuu inkaaraa guriga kii shar leh, Laakiinse rugta kuwa
xaqa ah wuu barakeeyaa. 34 Hubaal kuwa wax quudhsada
ayuu isagu quudhsadaa, Kuwa is-hoosaysiiyase nicmuu
siiyaa. 35 Kuwa xigmadda leh waxay dhaxli doonaan sharaf,
Laakiinse nacasyadu waxay u dallici doonaan ceeb.

4 Wiilashoy, aabbe edbintiisa maqla, Oo u jeesta inaad
wax garataan. 2 Waayo, anigu waxaan idin siiyaa tacliin
wanaagsan, Haddaba cilmigayga ha ka tegina. 3 Waayo,
aniguba waxaan aabbahay u ahaa wiil, Oo mid yar oo
bacbac ah oo madi ah ayaan u ahaa hooyaday. 4 Isagu wax
buu i baray, oo wuxuu igu yidhi, Qalbigaagu erayadayda ha
xajisto; Amarradaydana dhawr, oo waad noolaan doontaa. 5
Xigmadda doono, waxgarashadana doono; Hana illoobin, oo
erayada afkaygana dib ha uga noqon. 6 Xigmadda ha ka
tegin, oo way ku nabad gelin doontaa. Jeclow, oo way ku
dhawri doontaa. 7 Xigmaddu wax walbay ugu horraysaa,
sidaas daraaddeed xigmadda doono; Wax kastoo aad hesho
weliba waxgarasho doono. 8 Iyada sarraysii, oo iyana
way ku dallicin doontaa; Oo sharaf bay kuu yeeli doontaa
markaad iyada isku duubtid. 9 Iyadu waxay madaxaaga siin
doontaa wax sharraxsan, Oo waxayna kuu yeeli doontaa
taaj quruxsan. 10 Wiilkaygiiyow, maqal oo hadalladayda
aqbal. Oo sannadaha cimrigaaguna way badnaan doonaan.
11 Anigu waxaan ku baray jidkii xigmadda; Oo waxaan kugu
hoggaamiyey waddooyinkii qummanaanta. 12 Markii aad
socotid tallaabooyinkaagu cidhiidhi ma noqon doonaan, Oo
haddaad oroddidna ma turunturoon doontid. 13 Edbinta
xajiso, oo ha iska sii deyn; Hayso, waayo, iyadu waa
noloshaada, 14 Waddada kuwa sharka leh ha gelin, Oo

jidka xumaanfalayaashana ha qaadin. 15 Ka leexo, hana
marin, Ka noqo oo hareer ka mar. 16 Waayo, iyagu ma
seexdaan haddaanay xumaan falin, Oo hurdadoodana waa
laga qaadaa iyagoo cid kufiya mooyaane. 17 Waayo, iyagu
waxay cunaan kibistii sharnimada, Oo waxay cabbaan
khamrigii dulmiga. 18 Laakiinse waddada kuwa xaqa ahu
waa sida iftiinka waaberiga oo kale, Kaas oo hadba soo
kordha ilaa uu noqdo maalin cad. 19 Jidka kuwa sharka
lahuna waa sida gudcurka oo kale. Oo iyagu garan maayaan
waxay ku turunturoodaan. 20 Wiilkaygiiyow, erayadayda
dhegayso, Oo hadalladaydana dhegta u dhig. 21 Indhahaaga
hortooda yaanay ka fogaan, Oo qalbigaaga dhexdiisa ku
hayso, 22 Waayo, iyagu waa u nolol kuwa hela, Oo jidhkooda
oo dhanna waa u caafimaad. 23 Digtoonaan qalbigaaga
u dhawr, Waayo, isagay noloshu ka soo baxdaaye. 24 Af
qalloocan iska saar, Oo bushimo maroorsanna iska fogee.
25 Indhahaagu qummaati wax ha u fiiriyeen, Oo indhahaaga
daboolkooduna si toosan hortaada ha u eegeen. 26 Waddada
cagahaaga aad ugu fiirso, Oo jidadkaaga oo dhammuna ha
toosnaadeen. 27 Xagga midigta iyo xagga bidixda toona ha
u leexan, Oo cagtaadana xumaanta ka fogee.

**5** Wiilkaygiiyow, xigmaddayda dhegayso, Oo
waxgarashadaydana dhegta u dhig; 2 Si aad digtoonaan
u dhawrtid, Oo ay bushimahaaguna aqoon u xejiyaan. 3
Waayo, naagta qalaad bushimaheedu waxay daadiyaan
malab, Oo afkeeduna saliid buu ka sii macaan yahay,
4 Laakiinse aakhirkeedu wuxuu u qadhaadh yahay sida
geed dacareed oo kale, Wuuna af badan yahay sida seef
laba af leh. 5 Cagaheedu dhimashay ku dhaadhacaan,
Oo tallaabooyinkeeduna waxay u jeedaan xagga She'ool,
**(Sheol h7585)** 6 Waddada nolosha iyadu aad uguma fiirsato.
Jidadkeedu waa leexleexdaan, oo garan kari maysid, 7
Haddaba sidaas daraaddeed, wiilashoy, bal i maqla, Oo
erayada afkayga ha ka tegina. 8 Jidkaaga ka fogee iyada, Oo
albaabka gurigeeda ha u dhowaan, 9 Si aanad sharaftaada
kuwa kale u siin, Oo aanad sannadahaaga kuwa caloosha
adag u siin, 10 Si aan shisheeyayaal maalkaaga uga dhergin;
Oo aanay wixii aad u hawshootay guri ajnabi u gelin, 11 Si
aanad ugu dambaysta u barooran, Markay hilibkaaga iyo
jidhkaaguba baabba'aan, 12 Oo aad tidhaahdaan, Sidee
baan edbin u nebcaaday, Oo qalbigayguna canaantii u
quudhsaday! 13 Codkii macallimiintaydii ma aan addeecin,
Oo dhegtana uma aan dhigin kuwii wax i baray! 14 Anigu
waxaan u dhowaa inaan shar kasta falo Anigoo ku dhex
jira shirka iyo ururka. 15 Berkeddaada biyo ka cab, Oo
ceelkaagana biyo qulqulaya ka cab. 16 Ma hagaag baa
in ilahaagu dibadda u daataan. Oo ay durdurraduna
dariiqyada maraan? 17 Iyagu ha ahaadeen kuwaaga oo
keliya, Oo yaanay u ahaan shisheeyayaal adiga kula jira. 18
Ishaadu ha barakaysnaato, Oo naagtaadii aad yaraanta
ku guursatay ku faraxsanow. 19 Iyadu ha kuu ahaato sida
deerada jacaylka badan iyo sida cawsha quruxsan, Goor
walbana naasaheedu ha ku deeqeen Oo had iyo goorna
jacaylkeeda ku faraxsanow. 20 Haddaba wiilkaygiiyow, bal
maxaad naag qalaad ugu faraxsanaanaysaa, Maxaadse
naag shisheeye ah naasaheeda u qabsanaysaa? 21 Waayo,
jidadka dadku waxay hor yaalliin indhaha Rabbiga Oo isagaa
fiiriya waddooyinkiisa oo dhan. 22 Kan sharka leh waxaa
qabsan doonta xumaantiisa, Oo waxaa isaga lagu soo xidhi
doonaa xadhkaha dembigiisa. 23 Wuxuu u dhiman doonaa
edbinla'aanta, Oo isagu wuxuu ku dhex amban doonaa
badnaanta nacasnimadiisa.

**6** Wiilkaygiiyow, haddaad deriskaaga dammiin u noqotid,
Ama haddaad shisheeye gacanta dhaar ugu dhiibtid, 2
Markaas waxaa lagugu dabay erayada afkaaga, Oo waxaa
lagugu qabtay erayada afkaaga. 3 Haddaba, wiilkaygiiyow, bal
waxan samee oo isa samatabbixi, Waayo, gacantii deriskaagii
waad gashay; U tag, oo is-hoosaysii, oo deriskaaga bari.
4 Indhahaaga hurdo ha isugu keenin, Oo indhahaaga
daboolkoodana lulo ha isugu qaban. 5 Isu samatabbixi sida
cawl gacanta ugaadhsadaha uga baxsato, Iyo sida shimbir
gacanta shimbirdabaha uga baxsato. 6 Kaaga caajiska
ahow, bal qudhaanjada u tag, Oo bal jidadkeeda u fiirso oo
caqli yeelo, 7 Iyadoo aan lahayn madaxweyne, Sirkaal iyo
taliye toona, 8 Ayay guga cuntadeeda soo diyaarsataa, Oo
quudkeedana waxay soo urursataa wakhtiga beeraha la
goosto. 9 Haddaba kaaga caajiska ahow, ilaa goormaad
hurdaysaa? Goormaadse hurdadaada ka toosaysaa? 10
Weliba, in yar baad seexataa, in yar baad lulootaa, Oo in
yar baad gacmaha hurdo aawadeed u laabataa, 11 Hadda
caydhinimadaadu waxay u iman doontaa sida mid dad
dhaca, Oo baahidaaduna waxay u iman doontaa sida nin
hub wata. 12 Qofkii waxmatare ah, iyo ninkii sharrow ahuba,
Wuxuu ku socdaa af qalloocan; 13 Indhihiisuu ku baaqaa,
oo cagihiisuu ku hadlaa, Oo faruhuu wax ku baraa; 14
Qalbigiisa qalloocnaan baa ku jirta, had iyo goorna wuxuu
ku fikiraa shar, Oo wuxuu beeraa muran. 15 Haddaba sidaas
daraaddeed masiibadiisu degdeg bay u iman doontaa, Oo
dhaqso buu u jabi doonaa, dawona ma leh. 16 Waxaa
jira lix waxyaalood oo uu Rabbigu neceb yahay, Haah,
toddoba ayaa naftiisu aad u karahdaa, 17 Waana indho
kibir badan, carrab been sheega, Iyo gacmo dhiig aan

eed lahayn daadiya, 18 Qalbi male shar ah hindisa, Iyo
cago xumaan ku degdega, 19 Markhaati been ah oo been
sheega, Iyo kii muran dad walaalo ah ku dhex beera.
20 Wiilkaygiiyow, qaynuunka aabbahaa xaji, Oo amarka
hooyadaana ha ka tegin. 21 Had iyo goorba qalbiga ku
sido, Oo qoortana ku xidho. 22 Markaad socotid wuu ku
hoggaamin doonaa, Oo markaad seexatidna wuu ku dhawri
doonaa, Markaad toostidna wuu kula hadli doonaa. 23
Waayo, qaynuunku waa laambad, amarkuna waa iftiin, Oo
canaanashada edbintuna waa jidkii nolosha, 24 Inay kaa
dhawraan naagta sharka ah, Iyo sasabashada carrabka
naagta qalaad. 25 Quruxdeeda qalbigaaga ha ka damcin, Oo
yaanay indhaheeda daboolkooda kugu sasaban. 26 Waayo,
naag dhillo ah aawadeed waxaa nin la gaadhsiiyaa go' kibis
ah, Oo dhilladuna waxay ugaadhsataa nafta qaaligaa. 27
Miyuu nin laabta dab ku qaadi karaa, Iyadoo aan dharkiisu
guban? 28 Miyuu mid dhuxul kulul ku kor socon karaa, Iyadoo
aan cagihiisu guban? 29 Haddaba sidaas oo kaluu noqdaa
kii naagta deriskiisa u tagaa, Oo ku alla kii iyada taabtaaba
ma taqsiir la'aan doono. 30 Dadku tuug ma quudhsadaan
hadduu wax xado Inuu naftiisa dhergiyo markuu gaajoodo,
31 Laakiinse haddii isaga la qabto waa inuu toddoba jibbaar
u magdhabaa, Waa inuu ku bixiyaa waxa gurigiisa yaal
oo dhan. 32 Kii naag ka sinaystaa wuu caqli daranyahay,
Oo kii sidaas yeelaa naftiisuu halligaa. 33 Oo wuxuu heli
doonaa dhaawacyo iyo sharafdarro; Oo ceebtiisana lama
tirtiri doono innaba. 34 Waayo, hinaaso waa nin cadhadiis.
Maalinta aarsashadana isagu ma tudhi doono. 35 Isagu
innaba mag kaa qaadan maayo, oo sinaba kuula heshiin
maayo, In kastoo aad hadiyado badan siisid.

**7** Wiilkaygiiyow, erayadayda xaji, Oo amarradaydana
xaggaaga ku kaydso. 2 Amarradayda xaji aad noolaatide,
Oo sharcigaygana sida ishaada inankeeda u dhawr. 3
Farahaaga ku xidho, Oo looxa qalbigaagana ku qoro. 4
Waxaad xigmadda ku tidhaahdaa, Adigu waxaad tahay
walaashay, Oo waxgarashadana waxaad ugu yeedhaa,
saaxiibadday gacalisoy, 5 Si ay iyagu kaaga celiyaan naagta
qalaad, Taasoo erayadeeda kugu sasabata. 6 Waayo, anigoo
jooga daaqadda gurigayga Ayaan shabagga daaqadda wax
ka fiiriyey, 7 Oo kuwa garaadka daran ayaan fiiriyey, oo
waxaan barbaarrada ku dhex arkay Nin dhallinyaraa oo
aan innaba waxgarasho lahayn, 8 Isagoo maraya dariiqa
xaafaddeeda u dhow, Oo wuxuu raacay jidkii gurigeeda,
9 Oo waxay ahayd gabbaldhac oo makhribka ah, markii
habeenkii madoobaanayay oo gudcur noqonayay. 10 Oo bal
eeg, waxaa isagii ka hor timid naag Sidii dhillo u lebbisan,
oo qalbigeedu khiyaano miidhan yahay. 11 Iyadu waa
rabshad badan tahay, waana caasiyad, Oo gurigeeda cag
sooma dhigto. 12 Mar dibadday joogtaa, marna dariiqyaday
maraysaa, Oo rukun kasta wax bay ku sugtaa. 13 Haddaba
isagii way qabsatay, oo dhunkatay; Iyadoo aan wejigeedu
xishood lahayn ayay waxay isagii ku tidhi, 14 Anigu waxaan
hayaa allabaryo nabdeed, Oo maanta ayaan nidarradaydii
bixiyey. 15 Haddaba waxaan u soo baxay inaan kula kulmo,
Oo aan aad iyo aad wejigaaga u doondoono, waanan ku
helay. 16 Sariirtaydii waxaan ku goglay durraaxado daabac
leh, Iyo marooyin duntii Masar laga sameeyey. 17 Waxaan
sariirtaydii ku cadariyey Malmal iyo cuud iyo qorfe. 18 Kaalay,
oo aan caashaq ka dheregno ilaa aroorta, Oo aynu jacayl
ku faraxsanaanno. 19 Waayo, ninkaygii guriga ma joogo,
Oo meel fog buu u sodcaalay, 20 Kiish lacag ahna wuu
qaatay, Oo wuxuu guriga ku soo noqon doonaa markuu
dayaxu caddaado. 21 Hadalkeedii badnaa oo macaanaa
ayay isagii isku yeelsiisay, Oo waxay isagii ku qasabtay
faankii beenta ahaa oo bushimeheeda. 22 Oo haddiiba iyadii
buu daba galay, Sidii dibi loo wado in la gowraco, Ama sidii
nacas loo wado in silsilado lagu jebiyo, 23 Jeer fallaadh
beerka lagaga wareemo, Sida shimbiru dabinka degdeg
ku gasho, Iyadoo aan ogayn in loo dhigay si nafteeda loo
qaado. 24 Haddaba sidaas daraaddeed, wiilashoy, bal i
maqla, Oo erayada afkayga dhegaysta. 25 Qalbigiinnu yaanu
jidadkeeda u leexan, Oo waddooyinkeedana ha ku dhex
habaabina. 26 Waayo, iyadu waxay ridday kuwa badan oo
dhaawacan, Sida xaqiiqada kuway laysay aad bay u badan
yihiin. 27 Gurigeedu waa jidkii She'ool, Oo wuxuu hoos ugu
dhaadhacaa dhimashada qolladaheeda. **(Sheol h7585)**

**8** Haddaba xigmaddu sow ma dhawaaqin?
Waxgarashaduna codkeedii sow kor uma qaadin? 2
Waxay taagan tahay meelaha sarreeya Oo jidka agtiisa
ah, meesha waddooyinku ku kulmaan. 3 Oo waxay ka
qaylisaa irdaha agtooda, Meesha magaalada laga soo galo,
Iyo meesha albaabbada laga soo galoba. 4 Nimanyahow,
idinkaan idiin dhawaaqayaa, Oo codkayguna wuxuu u
yeedhayaa binu-aadmiga. 5 Garaadlaawayaashow, miyir
lahaada, Nacasyadoy, waxgarasho qalbiga ku haysta. 6 I
maqla, waayo, waxaan ku hadlayaa waxyaalo wanaagsan,
Oo waxaan bushimaha u kala qaadayaa waxyaalo qumman.
7 Maxaa yeelay, afkaygu run buu ku hadlayaa; Oo
bushimahayguna shar bay karhaan. 8 Erayada afkayga oo
dhammi waa xaq, Oo innaba wax qalloocan ama maroorsan
lagama helo. 9 Iyagu dhammaantood waa u cad yihiin kii wax
garanaya, Oo waana u qumman yihiin kuwa aqoonta hela.

10 Edbintayda qaata, lacagse ha qaadanina, Oo aqoontana
ka hor doorta dahabka saafiga ah. 11 Waayo, xigmaddu
waa ka sii wanaagsan tahay luulka, Oo wax alla waxa la
damci karo oo dhanna iyada lalama simi karo. 12 Anigoo
xigmad ahu, waxaan la fadhiyaa miyir, Oo waxaan helaa
aqoon iyo digtoonaan. 13 Rabbiga ka cabsashadiisu waa
in sharka la naco. Kibirka, iyo madaxweynaanta, iyo jidka
sharka, Iyo afka qalloocan ayaan anigu necbahay. 14 Talo
iyo xigmad anigaa iska leh, Oo waxaan ahay waxgarasho,
xoogna waan leeyahay. 15 Boqorradu gacantayday wax ku
xukumaan, Oo amiirraduna amarkaygay garta ku gooyaan.
16 Taliyayaasha iyo saraakiisha iyo weliba xaakinnada
dunida oo dhammuna Anigay wax iigu taliyaan. 17 Anigu
kuwa i jecel waan jeclahay, Oo kuwa aad iyo aad ii
doonaana way i heli doonaan. 18 Anigaa iska leh taajirnimo
iyo sharaf. Iyo weliba maal raagaya iyo xaqnimoba. 19
Midhahaygu way ka sii wanaagsan yihiin dahab, haah, oo
xataa dahab aad u wanaagsan way ka sii wanaagsan yihiin,
Oo waxa ii kordhaana way ka sii wanaagsan yihiin lacag
la doortay. 20 Anigu waxaan ku socdaa jidka xaqnimada,
Iyo waddooyinka garta dhexdooda, 21 Si aan kuwa i jecel
uga dhigo inay maal dhaxlaan, Oo aan khasnadahooda
ugu buuxiyo. 22 Rabbigu wuxuu i lahaan jiray bilowgii
jidkiisa Iyo shuqulladiisii hore ka hor. 23 Aniga aakhirada
hore waa lay taagay, waxaan jiray bilowgii ugu horreeyey,
Ama intaan dunidu jirin ka hor. 24 Anigu waxaan dhashay
intaan moolal jirin ka hor, Iyo intaanay jirin ilo biyo ka
buuxaan. 25 Intaan la qotomin buuraha Iyo kuraha ka hor
ayaan anigu dhashay, 26 Intaanuu isagu samayn dhulka
iyo berrimmada, Amase ciiddii dunida ugu horraysay. 27
Markuu samooyinka hagaajiyey anigu waan joogay, Markuu
xariijinta ku wareejiyey moolka dushiisa, 28 Markuu cirka
sare taagay, Markii ilaha moolku xoog yeesheen, 29 Markuu
badda xad u yeelay Si aan biyuhu amarkiisa ugu xadgudbin,
Markuu aasaaskii dhulka dhigay, 30 Markaas anigu isagaan
dhinac joogay, anigoo ah sidii hawlhoggaamiye, Oo anigu
maalin kasta faraxiisaan ahaa, Oo mar kasta hortiisaan ku
rayrayn jiray; 31 Waxaan ku rayrayn jiray inta dhulkiisa la
degay, Oo waxaan ku farxi jiray binu-aadmiga. 32 Haddaba
sidaas daraaddeed, wiilashoy, bal i maqla; Waayo, waxaa
barakaysan kuwa jidadkayga xajiya. 33 Edbinta dhegaysta,
oo caqli yeesha, Oo ha diidina. 34 Waxaa barakaysan
ninka i maqla, Oo maalin kasta irdahayga igu dhawra, Oo
albaabbadayda igu suga. 35 Waayo, ku alla kii i helaa wuxuu
helaa nolol, Oo Rabbiguna raalli buu ka ahaan doonaa. 36
Laakiinse kii igu dembaabaa naftiisuu wax yeelaa, Kuwa
aniga i neceb oo dhammu waxay jecel yihiin dhimasho.

9 Xigmaddu gurigeeday dhisatay, Toddobadeedii tiirna way
xaradhay. 2 Neefafkeedii ayay qashay, oo waxay isku
dartay khamrigeedii; Miiskeediina way diyaarisay. 3 Oo
gabdhaheedii midiidinnada ahaa ayay dirtay, oo waxay ka
qaylinaysaa Magaalada meelaha ugu sarreeya, iyadoo leh,
4 Ku alla kii garaaddaranu, halkan ha u soo leexdo. Oo kii
waxgarasho u baahanna waxay ku leedahay, 5 Kaalaya oo
kibistayda wax ka cuna, Oo khamriga aan isku darayna wax
ka cabba. 6 Garaadlaawayaashow, nacasnimada iska daaya,
oo noolaada, Oo jidka waxgarashadana mara. 7 Kii mid wax
quudhsada toosiyaa, cay buu isu soo jiidaa, Oo kii kan sharka
leh canaantana, ceeb baa ku dhacda. 8 Mid wax quudhsada
ha canaanan, waaba intaas oo uu ku necbaadaaye, Nin caqli
leh canaano, oo isna wuu ku jeclaan doonaa. 9 Nin caqli leh
wax bar, oo isna caqli wuu sii yeelan doonaa. Nin xaq ah
wax bar, oo isna waxbarasho wuu sii korodhsan doonaa.
10 Rabbiga in laga cabsado waa xigmadda bilowgeeda,
Oo Kan quduuska ah in la aqoonsadona waa waxgarasho.
11 Waayo, maalmahaagu anigay igu badan doonaan, Oo
cimrigaaguna waa sii kordhi doonaa. 12 Haddaad caqli
leedahay naftaadaad caqli u leedahay, Laakiinse haddaad
wax quudhsato, adiga uun baa waxquudhsashadaada
xambaaran doona. 13 Naagta nacasadda ahu waa qaylo
badan tahay, Iyadu way garaaddaran tahay, oo waxba ma
taqaan. 14 Waayo, waxay fadhiisataa illinka gurigeeda, Oo
kursi bay ku fadhiisataa meelaha sarsare ee magaalada,
15 Inay u yeedho kuwa jidka maraya, Iyagoo jidadkooda
iska sii soconaya, 16 Ku alla kii garaaddaranu halkan ha
u soo leexdo, Oo kii waxgarasho u baahanna waxay ku
leedahay, 17 Biyo la soo xaday way macaan yihiin. Oo cunto
qarsoodi loo cunaana wax bay ka farxisaa. 18 Laakiinse
isagu garan maayo in kuwii dhintay ay halkaas joogaan, Iyo
in martideedii ay She'ool guntiisa ku jiraan. **(Sheol h7585)**

10 Maahmaahyadii Sulaymaan. Wiilka caqliga lahu
aabbihiisuu ka farxiyaa, Laakiinse wiilka nacaska ahu
waa u caloolxumo hooyadiis. 2 Qasnadaha sharnimadu
faa'iido ma leh, Laakiinse xaqnimada ayaa dhimasho kaa
samatabbixisa. 3 Kii xaq ah naftiisu inay gaajooto Rabbigu u
oggolaan maayo, Laakiinse doonista kuwa sharka leh ayuu
ridaa. 4 Kii gacan caajis ah lahu wuu caydhoobaa, Laakiinse
kuwa dadaala gacantoodu hodan bay ka dhigtaa. 5 Kii guga
wax soo urursadaa waa wiil caqli leh, Laakiinse kii wakhtiga
beergooyska seexdaa waa wiil ceeb sameeya. 6 Barako
waxay saaran tahay kan xaqa ah madaxiisa, Laakiinse
kuwa sharka leh afkooda dulmi baa qariya. 7 Kan xaqa ah
xusuustiisu barako bay leedahay, Laakiinse kuwa sharka leh

magacoodu waa qudhmi doonaa. 8 Kii qalbiga caqli ku lahu
amarro buu aqbalaa, Laakiinse kan bushimaha ka nacaska
ahu afgembi buu u dhacaa. 9 Kii qummanaan ku socdaa
ammaan buu ku socdaa; Laakiinse kii jidadkiisa qalqallooociya
waa la ogaan doonaa. 10 Kii indhaha ku baaqaa murug buu
keenaa. Laakiinse kan bushimaha ka nacaska ahu afgembi
buu u dhacaa. 11 Ninkii xaq ah afkiisu waa il nololeed,
Laakiinse kuwa sharka leh afkooda dulmi baa qariya. 12
Necbaantu waxay kicisaa isqabashada, Laakiinse jacaylku
xadgudubyada oo dhan buu qariyaa. 13 Kii waxgarasho leh
bushimihiisa waxaa laga helaa xigmad, Laakiinse ushu waxay
u taal kan garaadka daran dhabarkiisa. 14 Dadkii caqli lahu
waxay kaydsadaan aqoon, Laakiinse nacaska afkiisu waa
baabba' dhow. 15 Ninkii hodan ah maalkiisu waa u magaalo
xoog leh, Laakiinse masaakiinta caydhnimadoodu waa u
baabba'. 16 Kuwa xaqa ah hawshoodu waxay u waddaa
nolol, Laakiinse waxa kan sharka leh u kordhaa, dembi bay
u sii kexeeyaan. 17 Kii edbinta xajistaa wuxuu ku socdaa
jidka nolosha, Laakiinse kii canaanta diidaa wuu qaldamaa.
18 Kii necbaanta qariyaa wuxuu leeyahay bushimo been
badan, Oo kii xanta ku hadlaana waa nacas. 19 Hadal badan
dembi lagama waayo, Laakiinse kii bushimihiisa ceshaa
caqli buu leeyahay. 20 Kii xaq ah carrabkiisu waa sida lacag
la doortay, Laakiinse kuwa sharka leh qalbigoodu waa qiimo
yar yahay. 21 Kii xaq ah bushimahiisu waxay masruufaan
kuwa badan, Laakiinse nacasyadu waxgarashola'aantooda
ayay u dhintaan. 22 Rabbiga barakadiisu hodan bay kaa
dhigtaa, Oo isna caloolxumo kuma daro. 23 Nacasku inuu
xumaan sameeyo waa u sidii cayaareed, Laakiinse ninka
garaadka lahu xigmad buu leeyahay. 24 Kii shar leh wuxuu
ka cabsado ayaa ku soo dul degi doona, Laakiinse kuwa
xaqa ah waxay doonayaan waa la siin doonaa. 25 Markii
dabaysha cirwareenta ahu dhaafto, ka sharka leh mar dambe
la arki maayo, Laakiinse kii xaq ahu waa aasaas weligiis
waaraya. 26 Khalku siduu ilkaha u yahay, iyo sida qiiqu
indhaha u yahay, Ayaa kan caajiska ahu u yahay kuwa isaga
dirta. 27 Rabbiga ka cabsashadiisu cimrigay dheeraysaa,
Laakiinse kuwa sharka leh cimrigoodu waa soo gaaban
doonaa. 28 Kuwa xaqa ah rajadoodu waa farxad, Laakiinse
kuwa sharka leh filashadoodu way baabbi'i doontaa. 29
Rabbiga jidkiisu waa u qalcad kuwa qumman; Laakiinse
xumaanfalayaasha waa u baabba'. 30 Kan xaqa ah weligiis
la dhaqaajin maayo, Laakiinse kuwa sharka lahu dhulka
ma fadhiyi doonaan. 31 Kan xaqa ah afkiisa waxaa ka soo
baxda xigmad, Laakiinse carrabkii qalloocan waa la gooyn
doonaa. 32 Kan xaqa ah bushimahiisu waxay yaqaaniin
waxa la aqbali karo, Laakiinse kan sharka leh afkiisu qallooc
buu ku hadlaa.

11 Kafaddii khiyaano ah Rabbigu aad buu u karhaa,
Laakiinse dhagaxii miisaanka oo xaq ah wuu ku
farxaa. 2 Markuu kibir yimaado, waxaa timaada ceeb;
Laakiinse xigmaddu waxay la jirtaa kuwa is-hoosaysiiya. 3
Kuwa qumman waxaa kaxayn doonta daacadnimadooda,
Laakiinse khaayinnada qalloocnaantoodu waa baabbi'in
doontaa iyaga. 4 Maalinta cadhada maal faa'iido ma leh,
Laakiinse xaqnimada ayaa dhimasho kaa samatabbixisa. 5
Ninkii kaamil ah xaqnimadiisu jidkiisay toosisaa, Laakiinse
kan sharka lahu wuxuu ku kufi doonaa sharkiisa. 6
Kuwa qumman xaqnimadoodaa samatabbixin doonta,
Laakiinse khaayinnada waxaa qabsan doona damacooda
xun. 7 Nin shar lahu markuu dhinto, wuxuu filanayay way
baabbi'i doontaa, Oo xumaanfalayaasha rajadooduna way
baabba'daa. 8 Kii xaq ah waxaa laga samatabbixiyaa
dhibaato, Oo meeshiisana waxaa yimaada kii shar leh. 9
Labawejiilahu afkiisuu deriskiisa ku halligaa, Laakiinse kan
xaqa ahu aqoon buu ku samatabbixi doonaa. 10 Kuwa xaqa
ahu markay barwaaqoobaan, magaaladu way rayraysaa,
Laakiin kuwa sharka lahu markay halligmaan farax baa
lagu dhawaaqaa. 11 Kuwa qumman ducadooda magaaladu
sare bay ugu kacdaa, Laakiinse kuwa sharka leh afkoodu
magaaladuu dumiyaa. 12 Kii deriskiisa quudhsadaa waa
caqli daranyahay, Laakiinse ninkii garaadka lahu wuu iska
aamusaa. 13 Kii sida mid xan badan u warwareegaa wuxuu
daaha ka qaadaa waxyaalo qarsoon, Laakiinse kii ruuxiisu
aamin yahay xaalkuu qariyaa. 14 Markaanay talo jirin, dadku
waa dhacaa, Laakiinse taliyayaasha badnaantoodu waxay
leedahay nabadgelyo. 15 Kii qof qalaad dammiintaa, xumaan
buu ka helaa, Laakiinse kii dammiinashada necebu ammaan
buu u fadhiyaa. 16 Naag nimcaysan sharaf bay haysataa,
Oo niman xoog lahuna maal bay haystaan. 17 Ninkii naxariis
badanu naftiisuu wanaag u sameeyaa, Laakiinse kii aan
naxariis lahaynu jidhkiisuu dhibaa. 18 Kan sharka lahu wuxuu
shaqaystaa mushahaaro khiyaano miidhan ah, Laakiinse kii
xaqnimada beeraa wuxuu heli doonaa abaalgud la hubo.
19 Xaqnimadu waxay u kacdaa xagga nolosha, Sidaas oo
kalena kii sharka raacaa wuxuu u raacaa dhimashadiisa.
20 Kuwa qalbigoodu qalloocan yahay Rabbigu aad buu u
karhaa; Laakiinse kuwa jidkooda ku qumman wuu ku farxaa.
21 Waxaan aad idiinku xaqiijinayaa inaan kan sharka lahu
taqsiirla'aan doonayn. Laakiinse farcanka kuwa xaqa ah
waa la samatabbixin doonaa. 22 Naag qurux badan oo aan
digtoonaan lahaynu Waa sida dahab gafuurka doofaarka ku

jira. 23 Kuwa xaqa ah waxay doonayaan wanaag keliya,
Laakiinse kuwa sharka ah filashadoodu waa cadho. 24
Waxaa jira mid wax firdhiya, oo haddana sii korodhsada; Oo
waxaa jira mid ceshada wax ka sii badan in ku habboon,
oo haddana sii caydhooba. 25 Qofkii deeqsi ah baa la
barwaaqaysiin doonaa, Oo kii wax waraabiyana, isna waa la
waraabin doonaa. 26 Kii hadhuudh ceshada, dadka ayaa
habaari doona, Laakiinse kii iibiya, duco ayaa ku dhici
doonta. 27 Kii wanaag aad u doonaa wuxuu doonayaa
raallinimo, Laakiinse kii xumaan doona, way u iman doontaa.
28 Kii maalkiisa isku halleeyaa wuu dhici doonaa, Laakiinse
kii xaq ahu wuxuu u barwaaqoobi doonaa sida caleen cagaar
ah. 29 Kii gurigiisa dhibaa dabayshu dhaxli doonaa, Oo
nacaskuna wuxuu midiidin u ahaan doonaa kan qalbigiisu
caqliga leeyahay. 30 Kan xaqa ah midhihiisu waa geed
nololeed, Oo kii nafo soo hanuuniyaana caqli buu leeyahay.
31 Bal eega, kan xaqa ahu abaalkiisuu dhulka ku heli doonaa,
Haddaba immisa abaalgud oo ka sii badan bay heli doonaan
kan sharka leh iyo dembiluhu.

**12** Ku alla kii edbinta jecelu aqoon buu jecel yahay,
Laakiinse kii canaanta necebu waa doqon. 2 Rabbigu
ninka wanaagsan raalli buu ka ahaan doonaa. Laakiinse
khaayinka wuu xukumi doonaa. 3 Ninna shar kuma dhismi
doono, Laakiinse kuwa xaqa ah xididkooda weligiis lama
dhaqaajin doono. 4 Naagtii toolmoonu waxay ninkeeda u
tahay taaj, Laakiinse tii ceebalay ahu waa sida qudhun
isaga lafaha kaga jira. 5 Kuwa xaqa ah fikirradoodu waa
qumman yihiin, Laakiinse kuwa sharka leh taladoodu waa
khiyaano. 6 Kuwa sharka leh erayadoodu waa gabbasho
ay u gabbadaan si ay dhiig u daadiyaan, Laakiinse kuwa
qumman afkooda ayaa samatabbixin doona. 7 Kuwa sharka
leh waa la afgembiyaa, oo mar dambena lama arki doono,
Laakiinse kuwa xaqa ah gurigoodu waa sii taagnaan doonaa.
8 Nin waxaa loogu bogi doonaa sida xigmaddiisu tahay,
Laakiinse kii qalbigiisu qalloocan yahay waa la quudhsan
doonaa. 9 Kii la fudaydsado oo midiidin lahu Waa ka
wanaagsan yahay kii isweyneeya oo cunto u baahan. 10 Nin
xaq ahu waa u tudhaa neefkiisa, Laakiinse kuwa sharka leh
naxdintoodu waa naxariisla'aan oo keliya. 11 Kii dhulkiisa
beertaa cunto badan buu ka dhergi doonaa, Laakiinse kii
waxmatarayaal raacaa waa garaad daranyahay. 12 Kan
sharka lahu wuxuu damcaa dabinka xumaanfalayaasha,
Laakiinse xididka kuwa xaqa ahu midhuu dhalaa. 13 Kan
sharka leh waxaa u dabin ah xadgudubka bushimihiisa,
Laakiinse kan xaqa ahu dhibaatada wuu ka bixi doonaa. 14
Nin wuxuu wanaag kaga dhergi doonaa midhaha afkiisa,
Oo nin walbana waxa gacmihiisu sameeyaan ayaa loo
abaalgudi doonaa. 15 Nacaska jidkiisu waa la qumman
yahay isaga, Laakiinse kii caqli lahu taladuu maqlaa. 16
Nacaska xanaaqiisa haddiiba waa la gartaa, Laakiinse
ninkii miyir lahu ceebtuu qariyaa. 17 Kii runta ku hadlaa
wuxuu muujiyaa xaqnimada, Laakiinse markhaatiga beenta
ahu wuxuu muujiyaa khiyaanada. 18 Waxaa jira mid u
hadla sida seef wax mudaysa, Laakiinse kan caqliga leh
carrabkiisu waa caafimaad. 19 Bushintii runta sheegtaa
weligeedba way sii taagnaan doontaa, Laakiinse carrabkii
beenta sheegaa daqiiqad buu joogaa. 20 Kuwa sharka ku
fikira qalbigooda khiyaanaa ku jirta, Laakiinse taliyayaasha
nabaddu farxad bay leeyihiin. 21 Sharna kan xaqa ah ku dhici
maayo, Laakiinse kuwa sharka leh xumaan baa ka buuxsami
doonta. 22 Bushimaha beenta sheega Rabbigu wuu karhaa.
Laakiinse kuwa runta ku shaqeeya wuu ku farxaa. 23 Ninkii
miyir lahu aqoontuu qariyaa, Laakiinse qalbiga nacasyadu
wuxuu naadiyaa nacasnimo. 24 Kuwa dadaala gacantoodu
wax bay xukumi doontaa, Laakiinse caajisiinta hawl baa la
saari doonaa. 25 Ninkii caloolxumo gashaa wuu soo gotaa,
Laakiinse eray wanaagsanu waa ka farxiyaa isaga. 26 Kan
xaqa ahu deriskiisuu hanuuniyaa, Laakiinse kuwa sharka
leh jidkoodu wuu ambiyaa iyaga. 27 Ninkii caajis ahu ma
dubto wuxuu soo ugaadhsaday, Laakiinse ninkii dadaala
maalkiisu waa qaali. 28 Jidka xaqnimada nolol baa taal; Oo
waddadeedana dhimasho kuma jirto.

**13** Wiilkii caqli lahu wuxuu maqlaa edbinta aabbihiis,
Laakiinse kii wax quudhsadaa canaanta ma maqlo.
2 Nin wuxuu wax wanaagsan ku cuni doonaa midhaha
afkiisa, Laakiinse khaayinnada naftoodu waxay cuni doontaa
midhaha dulmiga. 3 Kii afkiisa dhawraa wuxuu dhawraa
naftiisa, Laakiinse kii bushimihiisa aad u kala qaadaa
wuu baabbi'i doonaa. 4 Kii caajis ah naftiisu wax bay
damacdaa, mana hesho, Laakiinse nafta kii dadaala waa la
barwaaqaysiin doonaa. 5 Ninkii xaq ahu beenta wuu neceb
yahay, Laakiinse ninkii shar lahu waa karaahiyo, wuuna
ceeboobaa. 6 Xaqnimadu kii jidkiisu qumman yahay ayay
ilaalisaa, Laakiinse sharnimadu dembilaha ayay afgembidaa.
7 Waxaa jira nin hodan iska dhiga laakiinse aan waxba
haysan, Oo waxaa jira mid miskiin iska dhiga laakiinse maal
badan leh. 8 Nin wuxuu noloshiisa ku furtaa maalkiisa,
Laakiinse miskiinku canaanta ma maqlo. 9 Iftiinka kuwa
xaqa ahu weligii wuu reyreeyaa, Laakiinse laambadda kuwa
sharka leh waa la bakhtiin doonaa. 10 Isqabasho oo keliya
ayaa kibir ka timaada, Laakiinse kii waanada qaata waxaa
la jirta xigmad. 11 Maalkii degdeg lagu helaa wuu dhinmi

doonaa, Laakiinse kan hawl wax ku soo urursadaa waa sii
korodhsan doonaa. 12 Rajadii raagtaa qalbigay bukaysiisaa,
Laakiinse markii wixii la doonayay la helo waa geed nololeed.
13 Ku alla kii erayga quudhsadaa halligaad ayuu isu keenaa,
Laakiinse kii amarka ka cabsada waa loo abaalgudi doonaa.
14 Ninkii caqli leh waxbariddiisu waa il nololeed, In dabinnada
dhimashada laga leexdo. 15 Waxgarashadii wanaagsan
raalli baa laga noqdaa, Laakiinse jidka khaayinnadu waa xun
yahay. 16 Nin kasta oo miyir lahu aqoon buu ku shaqeeyaa,
Laakiinse nacasku nacasnimuu fidiyaa. 17 Wargeeyihii shar
lahu xumaan buu ku dhex dhacaa, Laakiinse ergadii aamin
ahu waa caafimaad. 18 Caydhnimo iyo ceebba waxaa lahaan
doona kii edbinta diida, Laakiinse kii canaanta maqla waa
la murwayn doonaa. 19 Wixii la doonayay oo la gaadhay
nafta way u macaan tahay, Laakiinse nacasyadu aad bay u
karhaan inay sharka ka fogaadaan. 20 Kii kuwa caqliga leh
la socdaa, caqli buu yeelan doonaa, Laakiinse kii nacasyada
raacaa waa baabbi'i doonaa. 21 Dembilayaasha waxaa
eryada shar, Laakiinse kuwa xaqa ah abaal wanaagsan baa
loo gudi doonaa. 22 Ninkii wanaagsanu dhaxal buu uga
tagaa carruurta carruurtiisa, Oo maalka dembilahana waxaa
loo kaydiyaa kuwa xaqa ah. 23 Beerta masaakiinta waxaa ku
taal cunto badan, Laakiinse gardarro aawadeed in baa loo
baabbi'iyaa. 24 Kii ushiisa ceshadaa wiilkiisuu neceb yahay;
Laakiinse kii wiilkiisa jecelu aad buu u edbiyaa. 25 Kan
xaqa ahu wax buu cunaa ilaa naftiisu dheregto, Laakiinse
caloosha kuwa sharka lahu way baahnaan doontaa.

**14** Naag kastoo caqli lahu gurigeeday dhistaa, Laakiinse
nacasaddu gacmaheeday ku dumisaa. 2 Kii
qummanaantiisa ku socda ayaa Rabbiga ka cabsada,
Laakiinse kii jidkiisa ku qalloocan wuu quudhsadaa isaga. 3
Afka nacasyada waxaa ka soo biqla kibir; Laakiinse kuwa
caqliga leh bushimahooda ayaa iyaga dhawri doona. 4
Meeshii aan dibi joogin qabaalkii ay wax ka cuni jireen waa
baabbah; Laakiinse kordhinta badanu waxay ku timaadaa
xoogga dibiga. 5 Markhaatigii aamin ahu been ma sheego,
Laakiinse markhaatigii been ahu been buu ku hadlaa. 6
Kii wax quudhsadaa xigmad buu doondoonaa, mana helo,
Laakiinse aqoontu waa u fudud dahay kii waxgarasho
leh. 7 Nacaska hortiisa ka fogow, Waayo, bushimihiisa
aqoon ka heli maysid. 8 Ninkii miyir leh xigmaddiisu waa
inuu jidkiisa gartaa, Laakiinse nacasyada nacasnimadoodu
waa khiyaano. 9 Nacasyadu dembigay ku majaajiloodaan,
Laakiinse kuwa qumman waxaa ku dhex jirta raallinimo.
10 Qalbigu qadhaadhnimadiisuu yaqaan, Oo shisheeyena
farxaddiisa lama qaybsado. 11 Guriga kuwa sharka leh waa
la afgembiyi doonaa, Laakiinse taambuugga kuwa qummanu
waa barwaaqoobi doonaa. 12 Waxaa jirta waddo dadka la
hagaagsan, Laakiinse dhammaadkeedu waa waddooyinka
dhimashada. 13 Qalbigu xataa qosol waa ku murugoodaa,
Oo farxad dhammaadkeeduna waa caloolxumo. 14 Kii
xaqnimada qalbigiisa dib ugaga noqdaa jidkiisuu ka dhergi
doonaa, Oo ninkii wanaagsanuna wuxuu ka dhergi doonaa
naftiisa. 15 Kii garaaddaranu eray kasta wuu rumaystaa,
Laakiinse kii miyir lahu socodkiisa aad buu u fiiriyaa.
16 Ninkii caqli lahu waa cabsadaa, oo sharka wuu ka
noqdaa; Laakiinse nacasku waa ciishoodaa, wuuna isku
kalsoon yahay. 17 Kii degdeg u cadhoodaa nacasnimuu
wax ku sameeyaa, Oo ninkii sharnimo hindisana waa la
neceb yahay. 18 Garaadlaawayaashu nacasnimay dhaxlaan,
Laakiinse kuwii miyir leh waxaa madaxa loo saaraa taaj
aqoon ah. 19 Kuwa sharka lahu kuwa wanaagsan hortooda
ayay ku foororsadaan, Oo kuwa xunxunna waxay ku
foororsadaan irdaha kuwa xaqa ah. 20 Miskiinka xataa
deriskiisu waa neceb yahay, Laakiinse taajirku saaxiibbo
badan buu leeyahay. 21 Kii deriskiisa quudhsadaa wuu
dembaabaa, Laakiinse kii miskiinka u naxariistaa waa
barakaysan yahay. 22 Kuwa sharka ku fikiraa sow ma
qaldamaan? Laakiinse kuwa wanaagga ku fikira waxaa u
ahaan doona naxariis iyo run. 23 Hawl kasta faa'iidaa ku jirta,
Laakiinse hadalka bushimuhu wuxuu keenaa caydhnimo
keliya. 24 Kuwa caqliga leh taajkoodu waa maalkooda,
Laakiinse nacasyada nacasnimadoodu waa nacasnimo
keliya. 25 Markhaatigii run ahu nafuu samatabbixiyaa,
Laakiinse kii been sheegaa waa khaayin. 26 Rabbiga ka
cabsashadiisu waxay leedahay kalsoonaan xoog leh, Oo
carruurtiisuna waxay lahaan doonaan meel ay magangalaan.
27 Rabbiga ka cabsashadiisu waa il nololeed, Si dabinnada
dhimashada looga leexdo. 28 Sharafta boqorku waxay ku
jirtaa dadka badnaantiisa, Laakiinse baabba'a amiirku wuxuu
ku jiraa dadka yaraantiisa. 29 Kii cadhada u gaabiyaa waa
garasho badan yahay; Laakiinse kii degdeg u cadhoodaa
nacasnimuu sarraysiiyaa. 30 Qalbigii degganu waa nolosha
jidhka, Laakiinse hinaaso waa qudhunka lafaha. 31 Kii
miskiinka dulmaa wuxuu caayaa Kan sameeyey, Laakiinse
kii ka baahan u naxariistaa wuu murweeyaa. 32 Kii shar leh
waxaa lagu afgembiyaa sharnimadiisa, Laakiinse kan xaqa
ahu rajuu leeyahay markuu dhinto. 33 Xigmaddu waxay
taal kii garasho leh qalbigiisa, Laakiinse wixii nacasyada
uurkooda ku jiraa waa ismuujiyaa. 34 Xaqnimadu quruun
way sarraysiisaa, Laakiinse dembigu waa u ceeb dad kasta.
35 Boqorka raallinimadiisa waxaa leh midiidinkii caqli ku

shaqeeya, Laakiinse wuxuu u cadhoon doonaa kii ceeb
sameeya.

**15** Jawaabta qaboobu cadhada way qaboojisaa, Laakiinse
hadalkii qallafsanu xanaaq buu kiciyaa. **2** Kuwa caqliga
leh carrabkoodu aqoon buu ku hadlaa, Laakiinse afka
nacasyadu wuxuu shubaa nacasnimo. **3** Rabbiga indhihiisu
meel kastay jiraan, Iyagoo fiirinaya kuwa xun iyo kuwa
wanaagsan. **4** Carrabka wanaagsanu waa geed nololeed
Laakiinse carrabka qalloocan ayaa qalbigu ku jabaa. **5**
Nacasku edbinta aabbihiis wuu quudhsadaa, Laakiinse kii
canaanta maqlaa miyir buu yeeshaa. **6** Kan xaqa ah gurigiisa
khasnad weyn baa taal, Laakiinse waxa kan sharka leh
u kordhaa waa dhib. **7** Kuwa caqliga leh bushimahoodu
aqoon bay faafiyaan, Laakiinse qalbiga nacasyadu sidaas
ma aha. **8** Allabariga kuwa sharka lahu Rabbiga waa u
karaahiyo, Laakiinse kuwa qumman baryadoodu isagay ka
farxisaa. **9** Jidka kan sharka lahu Rabbiga waa u karaahiyo,
Laakiinse isagu waa jecel yahay kii xaqnimada raaca. **10** Kii
jidka ka taga waa u taqsiir kulul, Oo kii canaanta necebuna
wuu dhiman doonaa. **11** She'ool iyo halligaaduba Rabbiga
hortiisay yaalliin, Haddaba intee in ka sii badan buu arkaa
qalbiga binu-aadmiga? **(Sheol h7585)** **12** Kii wax quudhsadaa
ma jecla in la canaanto, Oo dooni maayo inuu kuwa caqliga
leh u tago. **13** Qalbigii faraxsanu wejiguu nuuriyaa, Laakiinse
caloolxumaanta ayaa qalbigu ku jabaa. **14** Kii garasho leh
qalbigiisu aqoon buu doondoonaa, Laakiinse nacasyada
afkoodu wuxuu cunaa nacasnimo. **15** Kuwa dhibaataysan
maalmahooda oo dhammu waa xunxun yihiin, Laakiinse kii
qalbigiisu faraxsan yahay had iyo goorba waa u iid. **16** Wax
yar oo Rabbiga ka cabsashadiisu la jirto Ayaa ka wanaagsan
khasnado badan oo dhib la jirto. **17** Cunto khudaareed
oo jacayl la jiro Ayaa ka wanaagsan dibi la cayiliyey oo
nacayb la jiro. **18** Ninkii cadho badanu muran buu kiciyaa,
Laakiinse kii cadhada u gaabiyaa murankuu qaboojiyaa. **19**
Ninkii caajis ah jidkiisu waa sida meel qodxan leh oo kale,
Laakiinse kii xaq ah jidkiisu waa dariiq bannaan. **20** Wiilkii
caqli lahu aabbihiisuu ka farxiyaa, Laakiinse ninkii nacas ahu
hooyadiisuu quudhsadaa. **21** Nacasnimadu waa u farxad
ninkii caqlidaran, Laakiinse ninkii garasho lahu si qumman
buu u socdaa. **22** Meeshii aan talo jirin xaajooyinku waa
baabba', Laakiinse taliyayaashii badan ayay ku hagaagaan.
**23** Nin wuxuu farxad ka helaa jawaabta afkiisa, Oo eraygii
wakhti ku habboon la yidhaahdaana sidee buu u wanaagsan
yahay! **24** Jidka noloshu waa u kor kii caqli leh, Si uu
uga tago She'oolka hoose. **(Sheol h7585)** **25** Rabbigu wuu
dumin doonaa guriga kuwa kibirka leh, Laakiinse dhulka
carmalka xadkiisa wuu adkayn doonaa. **26** Rabbigu fikirrada
sharka ah aad buu u karhaa, Laakiinse kuwa daahirkaa
hadal wanaagsan bay ku hadlaan. **27** Kan faa'iido u hunguri
weynu reerkiisuu dhibaa, Laakiinse kii hadiyadaha necebu
wuu noolaan doonaa. **28** Kan xaqa ah qalbigiisu wuxuu
ka fikiraa sida loo jawaabo, Laakiinse kuwa sharka leh
afkoodu wuxuu shubaa waxyaalo shar ah. **29** Rabbigu kuwa
sharka leh wuu ka fog yahay, Laakiinse kuwa xaqa ah
baryadooduu maqlaa. **30** Indhaha nuurkoodu qalbiguu ka
farxiyaa, Oo warkii wanaagsanuna lafahuu barwaaqaysiiyaa.
**31** Dhegtii canaanta nolosha maqashaa Waxay joogi doontaa
kuwa caqliga leh dhexdooda. **32** Kii edbinta diidaa naftiisuu
quudhsadaa, Laakiinse kii canaanta maqlaa waxgarashuu
helaa. **33** Rabbiga ka cabsashadiisu waa edbinta xigmadda,
Oo sharaftana waxaa ka horreeya is-hoosaysiinta.

**16** Qalbiga qasdiyadiisa dadkaa leh, Laakiinse carrabka
jawaabtiisu xagga Rabbigay ka timaadaa. **2** Nin
jidadkiisa oo dhammu waa la nadiifsan yihiin isaga, Laakiinse
Rabbigu ruuxyaduu miisaamaa. **3** Shuqulladaada Rabbiga
ku aamin, Oo fikirradaaduna way taagnaan doonaan. **4**
Rabbigu wax kastuu isu abuuray, Haah, oo xataa ka sharka
leh wuxuu u abuuray maalinta sharkaa. **5** Ku alla kii qalbiga
ka kibirsanu Rabbiga waa u karaahiyo, Waxaan aad idiin ku
xaqiijinayaa inaan isagu taqsiir la'aan doonayn. **6** Waxaa
dembiga lagu kafaaraggudaa naxariis iyo run, Oo dadkuna
waxay sharka kaga fogaadaan Rabbiga ka cabsashadiisa. **7**
Markii Rabbigu ku farxo nin jidadkiis, Wuxuu nabad dhex
dhigaa isaga iyo xataa cadaawayaashiisa. **8** Wax yar oo
xaqnimo la jirto Ayaa ka wanaagsan wax badan oo kordha
oo xaqdarro la jirto. **9** Nin walba qalbigiisaa jidkiisa u fiirsada,
Laakiinse Rabbigaa tallaabooyinkiisa toosiya. **10** Xukunka
Rabbigu wuxuu ku jiraa bushimaha boqorka, Afkiisuna
kuma xadgudbo garsooridda. **11** Miisaankii iyo kafadihii xaq
ah Rabbigaa leh, Dhagaxyada miisaanka oo kiishka ku
jira oo dhammuna waa shuqulkiisa. **12** Waa u karaahiyo
boqorrada inay xumaan falaan. Waayo, carshigu xaqnimuu
ku dhismaa. **13** Boqorradu bushimaha xaqa ah way ku
farxaan, Oo kii si qumman u hadlana way jecel yihiin.
**14** Boqor cadhadiisu waa sida warqaadayaal geeriyeed,
Laakiinse nin caqli leh ayaa qaboojin doona. **15** Nuurka
wejiga boqorka nolol baa ku jirta, Oo raallinimadiisuna
waa sida daruurta roobka dambe. **16** In xigmad la helaa
intee bay ka sii wanaagsan tahay in dahab la helo! In
waxgarasho la helaana waa laga doortaa in lacag la helo. **17**
Kuwa qumman jidkoodu waa inay sharka ka leexdaan, Kii
jidkiisa dhawraa naftiisuu ilaaliyaa. **18** Kibirku wuxuu hor

socdaa baabba', Oo madaxweynaanuna waxay hor socotaa
dhicid. 19 In kuwa kibirsan booli lala qaybsado Waxaa ka sii
wanaagsan in kuwa hooseeya laysla sii hoosaysiiyo. 20 Kii
hadalka dhegaystaa wax wanaagsan buu heli doonaa, Oo
ku alla kii Rabbiga aaminaana waa barakaysan yahay. 21
Kii qalbigiisu caqli leeyahay waxaa loogu yeedhi doonaa
mid miyir leh, Oo bushimaha macaankooduna waxbarashuu
kordhiyaa. 22 Waxgarashadu waa u il nololeed kii haysta,
Laakiinse edbinta nacasyadu waa nacasnimo. 23 Kii caqli leh
qalbigiisu afkiisuu wax baraa, Oo waxbarashuu bushimihiisa
u kordhiyaa. 24 Hadalkii wacanu waa sida awlallo shinniyeed
oo kale, Nafta wuu u macaan yahay, oo lafahana waa
u caafimaad. 25 Waxaa jirta waddo dadka la qumman,
Laakiinse dhammaadkeedu waa jidadkii dhimashada. 26
Kii hawshooda gaajadiisuu u hawshoodaa, Waayo, afkiisaa
qasba isaga. 27 Ninkii waxmatare ahu xumaan buu qodqodaa,
Oo bushimihiisana waxaa ku jira dab wax gubaya. 28 Ninkii
qalloocanu muran buu beeraa, Oo kii xan badanuna wuxuu
kala kaxeeyaa saaxiibbo. 29 Ninka wax dulmaa deriskiisuu
sasabtaa, Oo wuxuu u kaxeeyaa jid aan wanaagsanayn.
30 Kii indhaha isugu qabta inuu wax qalloocan hindiso, Oo
bushimihiisa qaniinaa, shar buu soo wadaa. 31 Madaxa cirro
lahu waa taaj sharfeed Haddii laga helo jidka xaqnimada.
32 Kii cadhada u gaabiyaa waa ka wanaagsan yahay kii
xoog badan, Oo kii ruuxiisa xukumaana waa ka wanaagsan
yahay kii magaalo qabsada. 33 Saamiga waxaa lagu tuuraa
dhabta, Laakiinse go'aankiisa oo dhan Rabbigaa leh.

**17** Wuxoogaa cunto qallalan ah oo xasilloonaanu la jirto
Ayaa ka wanaagsan guri hilib allabari ka buuxo oo
diriru la jirto. 2 Addoonkii caqli lahu wuxuu xukumi doonaa
wiilkii ceeb soo jiida, Oo walaalaha ayuu la dhaxal geli
doonaa. 3 Weelka lacagta lagu safeeyo lacagtaa iska leh, oo
foornadana dahabkaa iska leh, Laakiinse Rabbigu qalbiyaduu
imtixaamaa. 4 Xumaanfaluhu wuxuu maqlaa bushimaha
shar leh, Oo beenaaluhuna wuxuu dhegaystaa carrabka
xun. 5 Ku alla kii miskiinka ku majaajiloodaa wuxuu caayaa
Kan sameeyey, Kii belaayooyin ku farxaana ma taqsiir la'aan
doono. 6 Odayaasha waxaa taaj u ah carruurta carruurtooda,
Oo sharafta carruurtuna waa aabbayaashood. 7 Hadalkii
weynu nacas uma eka, Sidaas oo kalena bushimihii been
sheegaa amiir uma eka. 8 Hadiyaddu waxay kii haysta
la tahay sida dhagax qaali ah, Oo meel alla meeshay u
leexataba way ku barwaaqowdaa. 9 Kii xadgudub qariyaa
jacayl buu doondoonaa, Laakiinse kii xaal ku noqnoqdaa
saaxiibbuu kala kaxeeyaa. 10 Canaantu waxay ninkii garasho
leh u tartaa In ka badan boqol jeedal oo nacas lagu dhuftay
ay u taraan. 11 Ninkii shar lahu wuxuu doondoonaa caasinimo
keliya, Sidaas daraaddeed waxaa isaga lagu diri doonaa
farriingeeye aan naxariis lahayn. 12 Nin ha la kulmo orso
dhasheeda laga xaday, Intuu nacas nacasnimo samaynaya
la kulmi lahaa. 13 Ku alla kii wanaag xumaan ku celiyaa,
Gurigiisa xumaanu ka fogaan mayso. 14 Muranka bilowgiisu
waa sida biyo la soo faruuray. Haddaba isqabashada iska
daa intaan lays ilaaqin. 15 Kii kan sharka leh xaq ka dhiga,
iyo kii kan xaqa ah gardarro ku xukuma, Labadaba Rabbigu
aad buu u karhaa. 16 Lacagta nacaska gacantiisa ku jirtaa
bal maxay u tartaa inuu xigmad ku soo iibsado, Waayo, isagu
garasho ma leh? 17 Had iyo goor saaxiibba saaxiibkii wuu
jecel yahay, Walaalna wuxuu u dhashay dhibaato. 18 Ninkii
garaaddaranu gacan buu dhaar ugu dhiibaa, Oo wuxuu
dammiin ku noqdaa deriskiisa hortiisa. 19 Kii xadgudub jecelu
muran buu jecel yahay, Oo kii iriddiisa sarraysiiyaana wuxuu
doondoontaa baabba'. 20 Kii qalbi qalloocan lahu wanaag
ma helo, Oo kii carrab maroorsan lahuna wuxuu ku dhex
dhacaa belaayo. 21 Kii nacas dhalaa murugtiisuu u dhalaa,
Oo nacas aabbihiisna farxad ma leh. 22 Qalbigii faraxsanu
waa dawo wanaagsan, Laakiinse qalbigii jabanu lafahuu
engejiyaa. 23 Ninkii shar lahu laabtuu laaluush ka qaataa,
Si uu jidadka garta u qalloociyo. 24 Xigmaddu waxay hor
joogtaa kii garasho leh; Laakiinse nacaska indhihiisu waxay
eegaan dhulka darafkiisa. 25 Wiilkii nacas ahu waa u murug
aabbihiis, Waana u qadhaadh tii dashay. 26 Weliba ma
wanaagsana in kii xaq ah la taqsiiro, Ama in kuwa sharafka
leh qummanaantooda aawadeed wax loogu dhufto. 27 Kii
hadalkiisa yareeyaa, aqoon buu leeyahay, Oo kii qalbigiisu
qabow yahayna waa nin garasho leh. 28 Xataa nacasku
markuu iska aamusan yahay waxaa loo yaqaan mid caqli
leh, Kii bushimihiisa isku qabtana nin miyir leh.

**18** Kii gooni isu soocaa, wuxuu doondoonaa damaciisa,
Oo xigmadda oo dhanna wuu ku kacaa. 2 Nacasku
waxgarashada kuma farxo, Laakiinse wuxuu ku farxaa uun
inuu waxa qalbigiisa ku jira muujiyo. 3 Markii kii shar lahu
yimaado waxaa kaloo timaada quudhsasho, Sharafla'aantana
waxaa la timaada ceeb. 4 Nin afkiis erayada ku jiraa waa
sida biyo gun dheer, Oo isha xigmadduna waa sida durdur
socda. 5 Ma wanaagsana in kan sharka leh loo eexdo,
Ama in kan xaqa ah garta lagu afgembiyo. 6 Nacaska
bushimihiisu waxay keenaan muran, Oo afkiisuna wuxuu u
yeedhaa karbaash. 7 Nacaska afkiisu waa u baabba', Oo
bushimihiisuna naftiisay dabin u noqdaan. 8 Kii xan badan
erayadiisu waa sida cunto macaan, Oo waxay ku degaan
meelaha caloosha ugu hooseeya. 9 Kii shuqulkiisa caajis ku

ahu, Wuxuu walaal u yahay kii wax kharriba. 10 Rabbiga
magiciisu waa noobiyad xoog leh, Kii xaq ahu iyaduu ku
cararaa, meel sarena wuu ku nabad galaa. 11 Ninkii taajir
ah maalkiisu waa u magaalo xoog leh, Oo waa u derbi
dheer sida ay la tahay isaga. 12 Dadka qalbigiisu waa kibraa
intaanu baabbi'in ka hor, Oo sharaftana waxaa ka horraysa
is-hoosaysiinta. 13 Kii xaajo ka jawaabaa isagoo aan maqlin,
Waa u nacasnimo iyo ceeb. 14 Nin qalbigiisu waa u adkaysan
karaa cudurkiisa, Laakiinse qalbi jaban bal yaa u dulqaadan
kara? 15 Kii miyir leh qalbigiisu wuxuu helaa aqoon, Oo
kuwa caqliga leh dhegtooduna waxay doondoontaa aqoon.
16 Nin hadiyaddiisu meel bay u bannaysaa. Oo waxay isaga
hor keentaa rag waaweyn. 17 Kii dacwaddiisa u hor mara,
mid xaq ah baa la moodaa, Laakiinse deriskiisaa ka daba
yimaada oo imtixaama isaga. 18 Saamigu wuxuu joojiyaa
murammo, Oo wuxuu kala kaxeeyaa kuwa xoogga badan.
19 In walaal la xumeeyey la soo celiyo waa ka sii adag tahay
in magaalo xoog leh la qabsado, Oo murammona waa ka
xoog badan yihiin qalcad biraheeda. 20 Nin calooshiisu
waxay ka buuxsami doontaa midhaha afkiisa, Oo wuxuu
isagu ka dhergi doonaa waxa bushimihiisa u kordha. 21
Geeri iyo nololuba waxay ku jiraan itaalka carrabka, Oo
kuwa jeceluna waxay cuni doonaan midhihiisa. 22 Ku alla
kii afo helaa wuxuu helaa wax wanaagsan, Oo Rabbigana
raallinimuu ka helaa. 23 Miskiinku baryootan buu ku hadlaa,
Laakiinse taajirku si qallafsan buu ugu jawaabaa. 24 Ninkii
saaxiibbo badsadaa naftiisuu kharribaa, Laakiin waxaa jira
saaxiib walaalkaa kaaga dhow.

**19** Miskiinka daacadnimadiisa ku socda ayaa ka
wanaagsan Nacaska bushimihiisu qalloocan yihiin. 2
Oo weliba in naftu aqoon la'aato ma wanaagsana, Oo kii
cagihiisu degdegaanna wuu ambadaa. 3 Nin nacasnimadiisu
jidkiisay qalloocisaa, Oo isagu qalbigiisa ayuu Rabbiga uga
cadhoodaa. 4 Maalku wuxuu badiyaa saaxiibbo, Laakiinse
miskiinku saaxiibkiisa buu ka soocmaa. 5 Markhaatigii been
ahu ma taqsiir la'aan doono, Oo kii been ku hadlaana ma
baxsan doono. 6 Kuwa badan ayaa deeqsiga raallinimo ka
baryi doona, Oo nin kastaaba waa u saaxiib kii hadiyado
bixiya. 7 Miskiinka walaalihiis oo dhammu way neceb yihiin,
Haddaba saaxiibbadiisuna intee bay ka fogaan doonaan!
Isagu hadal buu kala daba tagaa iyaga, laakiinse way
tageen. 8 Kii xigmadda helaa naftiisuu jecel yahay, Oo kii
waxgarashada xajistaana wax wanaagsan buu heli doonaa.
9 Markhaatigii been ahu ma taqsiir la'aan doono, Oo kii been
ku hadlaana wuu halligmi doonaa. 10 Nacaska raaxo uma
eka, Waxaana taas ka sii liita in addoon amiirro xukumo.
11 Nin miyirkiisu cadho buu ka celiyaa, Oo waxaa isaga
ammaan u ah inuu xadgudub dhaafo. 12 Boqorka cadhadiisu
waa sida libaaxa cidiisa, Laakiinse raallinimadiisu waa
sida sayaxa cawska ku dega. 13 Wiilkii nacas ahu waa u
belaayo aabbihiis, Oo naag murammadeeduna waa sida
dhibicyo aan kala go'in. 14 Hoy iyo hanti aabbayaashaa
laga dhaxlaa, Laakiinse afo miyir leh xagga Rabbigaa laga
helaa. 15 Caajisnimo waxay keentaa hurdo weyn, Oo qofkii
caajis ahuna wuu gaajoon doonaa. 16 Kii amarka dhawraa
naftiisuu dhawraa, Laakiinse kii jidadkiisa fudaydsadaa wuu
dhiman doonaa. 17 Kii miskiinka u naxaa Rabbiguu wax
amaahiyaa, Oo wanaaggii uu sameeyeyna wuu u celin
doonaa. 18 Wiilkaaga edbi intay rajo jirto, Laakiinse naftaada
ha ku qasbin si uu u dhinto. 19 Ninkii cadho badan waa la
taqsiiri doonaa, Waayo, haddaad mar isaga samatabbixiso,
haddana waa inaad mar kale sidii oo kale ku samaysaa. 20
Talada maqal, oo edbinta qaado, Si aad ugu dambaystaada
caqli u yeelatid. 21 Nin qalbigiisa waxaa ku jira hindisooyin
badan, Habase ahaatee waxaa taagnaan doonta talada
Rabbiga. 22 Nin waxaa loo doonayaa waa raxmaddiisa,
Oo miskiinkuna waa ka wanaagsan yahay beenaalaha.
23 Kii Rabbiga ka cabsada waxaa loo kaxeeyaa xagga
nolosha, Wuuna sii dheregsanaan doonaa, Oo sharna loo
keeni maayo. 24 Ninkii caajis ahu wuxuu gacanta geliyaa
xeedhada, Oo mar dambe xagga afkiisa uma soo celiyo.
25 Kan wax quudhsada garaac, oo garaadlaawaha ayaa
miyir yeelan doona, Oo kii garasho leh canaano, oo isna
aqoon buu sii korodhsan doonaa. 26 Kii aabbihiis kharriba,
hooyadiisna erya, Waa wiil ceeb keena oo cay soo jiida.
27 Wiilkaygiiyow ka joogso in markaad edbinta maqashid
Aad dabadeed hadalka aqoonta ka ambatid. 28 Markhaatigii
waxmatare ahu gartuu quudhsadaa, Oo kan sharka leh
afkiisuna wuxuu liqaa xumaan. 29 Kuwa wax quudhsada
waxaa loo diyaariyey xukunno, Oo dhabarka nacasyadana
waxaa loo diyaariyey karbaash.

**20** Khamri waa dadquudhsade, waxa lagu sakhraamona
waa qaylokiciye, Oo ku alla kii ku qaldamaana caqli
ma laha. 2 Boqorka cabsigeliddiisu waa sida libaaxa cidiisa,
Oo ku alla kii ka xanaajiyaa, naftiisuu ku dembaabaa. 3 Nin
inuu dirir ka joogsado waa u sharaf, Laakiinse nacas waluba
wuu ilaaqtamaa. 4 Kii caajis ahu qabowga aawadiis beer ma
jeexo, Oo sidaas daraaddeed wakhtiga beergooyska wuu
baryootami doonaa, oo waxba ma heli doono. 5 Talada dadka
qalbigiisa ku jirtaa waa sida biyo gun dheer, Laakiinse ninkii
garasho leh ayaa ka soo dhaansan doona. 6 Dadka intooda
badanu waxay naadiyaan raxmaddooda, Laakiinse nin aamin
ah bal yaa heli kara? 7 Ninka xaqa ah oo daacadnimadiisa ku

socda, Carruurtiisu way barakaysnaadaan isaga dabadiis. 8
Boqorkii carshiga garsooridda ku fadhiyaa Indhihiisuu sharka
oo dhan ku kala firdhiyaa. 9 Bal yaa odhan kara, Qalbigayga
waan nadiifiyey, Oo dembigayga waan ka daahirsanahay? 10
Miisaanno kala cayn ah iyo qiyaaso kala cayn ah, Labaduba
Rabbiga waa u karaahiyo. 11 Xataa ilmo yar waxaa lagu
yaqaan falimihiisa, Inuu shuqulkiisu daahir yahay iyo inuu
hagaagsan yahayba. 12 Dhegta wax maqasha iyo isha
wax aragtaba, Labadaba Rabbigaa sameeyey. 13 Hurdo
ha jeclaan, waaba intaas oo aad caydhowdaaye. Indhaha
kala qaad, oo cuntaad ka dhergi doontaa. 14 Kan wax
iibsadaa wuxuu yidhaahdaa, Waa xun yahay, waa xun
yahay, Laakiinse markuu tago ayuu faanaa. 15 Waxaa jira
dahab iyo luul badan, Laakiinse bushimihii aqoon lahu waa
jawharad qaali ah. 16 Kii qof qalaad dammiinta dharkiisa ka
qaad, Oo markuu shisheeyayaal dammiinto, isaga rahmad
ahaan u hay. 17 Cuntadii khiyaano lagu helaa dadka way
u macaan tahay, Laakiinse dabadeed afkiisa waxaa ka
buuxsami doona quruurux. 18 Qasdi kasta waxaa lagu
taagaa talo, Oo waano wanaagsan ku dagaallan. 19 Kii
sida mid xan badan u warwareegaa wuxuu daaha ka
qaadaa waxyaalo qarsoon, Haddaba sidaas daraaddeed kii
bushimihiisa kala qaada ha ku darsamin. 20 Kii aabbihiis
ama hooyadiis caaya, Laambaddiisa waxaa lagu bakhtiin
doonaa gudcur dam ah. 21 Dhaxalkii markii hore degdeg
lagu helay, Ugu dambaysta ma barakoobi doono. 22 Ha
odhan, Shar baan ka abaalgudayaa. Rabbiga sug, oo isna
wuu ku badbaadin doonaa. 23 Miisaanno kala cayn ahu
Rabbiga waa u karaahiyo, Oo kafaddii khiyaano ahuna
ma wanaagsana. 24 Nin socodkiisu waa xagga Rabbiga,
Haddaba sidaas daraaddeed dad sidee buu jidkiisa u garan
karaa? 25 Waa u dabin nin inuu nacasnimo ku yidhaahdo,
Waa quduus, Oo uu dabadeed u nidraa inuu wax weyddiiyo.
26 Boqorkii caqli lahu kuwa sharka leh wuu hufaa, Oo
wuxuu dushooda marsiiyaa giringirta. 27 Dadka ruuxiisu
waa laambaddii Rabbiga, Oo wuxuu baadhaa caloosha
meelaha ugu hooseeya oo dhan. 28 Naxariista iyo runtu
boqorkay ilaaliyaan, Oo carshigiisuna wuxuu ku taagnaadaa
naxariis. 29 Dhallinyarada xooggoodu waa ammaantooda,
Oo cirrada odayaashuna waa quruxdooda. 30 Garaaciddii
nabro yeeshaa waxay dadka ka nadiifisaa sharka, Oo dilidda
karbaashkuna sidaas oo kalay u gashaa caloosha meelaha
ugu hooseeya.

**21** Boqorka qalbigiisu wuxuu ku jiraa gacanta Rabbiga
sida webiyada biyaha ah, Oo wuxuu u leexiyaa meel
alla meeshuu doonayo. 2 Nin jidkiis waluba waa la qumman
yahay isaga, Laakiinse Rabbigu qalbiyaduu miisaamaa. 3
Waxaa Rabbigu allabari ka sii jecel yahay In xaqnimo iyo gar
la sameeyo. 4 Indho qab weyn iyo qalbi kibirsan, Kuwaas
oo ah kuwa sharka leh laambaddoodu waa dembi. 5 Kuwa
dadaala fikirradoodu waxay u geeyaan barwaaqo. Laakiinse
ku alla kii degdeg badanu wuxuu u degdegaa inuu wax u
baahdo oo keliya. 6 Khasnadihii carrab been badan lagu
helaa waa sida ceeryaamo hor iyo dib loo kaxeeyey, Oo
kuwa doondoontaana dhimashay doonaan. 7 Kuwa sharka
leh dhacoodu iyaguu baabbi'in doonaa, Maxaa yeelay, iyagu
waxay diidaan inay gar sameeyaan. 8 Ninkii eed badan
qaba jidkiisu aad buu u qalloocan yahay, Laakiinse kii
daahirsan shuqulkiisu waa hagaagsan yahay. 9 In guriga
dushiisa dhinac laga joogo ayaa ka roon In guri weyn naag
muran badan lala joogo. 10 Kii shar leh naftiisu xumaan bay
doonaysaa, Oo deriskiisuna raallinimo kama helo hortiisa. 11
Markii mid wax quudhsada la taqsiiro, garaadlaawahu wuu
caqliyaystaa, Oo kii caqli leh marka la edbiyona aqoon buu
helaa. 12 Kii xaq ahu wuxuu ka fikiraa kii shar leh gurigiisa,
Iyo sida kuwa sharka leh loogu afgembiyo sharnimadooda
daraaddeed. 13 Kii dhegihiisa u fureeyaa si aanu qaylada
miskiinka u maqlin, Isaga qudhiisuna wuu qaylin doonaa,
laakiinse lama maqli doono. 14 Hadiyaddii qarsoodi lagu
bixiyaa xanaaqay qabowjisaa, Oo laaluushkii laabta laysu
geliyaana cadho kulul buu qabowjiyaa. 15 Kii xaq ahu inuu
gar sameeyo waa u farxad, Laakiinse kuwa xumaanta ka
shaqeeya waa u baabba'. 16 Ninkii jidka waxgarashada ka
habaabaa Wuxuu la joogi doonaa ururka kuwii dhintay. 17 Kii
raaxaysi jecelu miskiin buu ahaan doonaa, Oo kii khamri iyo
saliid jeceluna taajir ma noqon doono. 18 Kii shar lahu wuxuu
furasho u noqon doonaa kii xaq ah, Khaayinkuna wuxuu
furasho u noqon doonaa kii qumman. 19 In lamadegaanka
la joogo ayaa ka roon In naag muran iyo cadho badan
lala joogo. 20 Khasnad qaali ah iyo saliid baa ku jira kan
caqliga leh gurigiisa, Laakiinse nacasku wixiisa wuu wada
liqaa. 21 Kii xaqnimo iyo naxariis raacaa Wuxuu helaa
nolol iyo xaqnimo iyo sharaf. 22 Kii caqli lahu kor buu
ugu baxaa magaalada kuwa xoogga badan derbigeeda,
Oo weliba xoogga ay isku hallaynayaan oo dhan ayuu
hoos u ridaa. 23 Ku alla kii afkiisa iyo carrabkiisa dhawraa
Naftiisuu dhibaatooyin ka dhawraa. 24 Ninkii kibirsan ee
qab weyn waxaa magiciisa la yidhaahdaa quudhsade, Oo
wuxuu ku shaqeeyaa cadhada kibirka. 25 Ninkii caajis ah
waxaa dila damaciisa, Waayo, gacmihiisu waxay diidaan
inay hawshoodaan. 26 Waxaa jira kuwo maalinta oo dhan
si hunguri weyn wax u damca, Laakiinse kii xaq ahu wax
buu bixiyaa oo ma ceshado. 27 Ka sharka leh allabarigiisu

waa karaahiyo, Oo markuu niyo xun ku bixiyona way ka sii
daran tahay! **28** Markhaatifuraha beenta ahu waa baabbi'i
doonaa, Laakiinse ninkii wax maqla hadalkiisu waa raagi
doonaa. **29** Ninkii shar lahu wejigiisuu adkeeyaa, Laakiinse
kii qummanu jidadkiisuu u fiirsadaa. **30** Ma jirto xigmad ama
waxgarasho Ama talo Rabbiga ka gees ah. **31** Faraska
waxaa loo diyaariyaa maalinta dagaalka, Laakiinse guusha
waxaa leh Rabbiga.

**22** Magac wanaagsan baa laga doortaa maal badan, Oo
nimcana waa ka wanaagsan tahay lacag iyo dahab. **2**
Taajirka iyo miskiinku way wada kulmaan, Oo Rabbigu waa
kii kulligood sameeyey. **3** Ninkii miyir lahu sharkuu arkaa,
wuuna dhuuntaa, Laakiinse garaadlaawayaashu way iska sii
maraan, waana la taqsiiraa. **4** Is-hoosaysiinta iyo Rabbiga ka
cabsashadiisa abaalgudkoodu Waxaa weeyaan hodantinimo
iyo sharaf iyo nolol. **5** Qodxan iyo dabinnaba waxay yaalliin
jidka ninka qalloocan, Laakiinse kii naftiisa dhawraa waa
ka fogaan doonaa iyaga. **6** Ilmo u rabbee siduu ku socon
lahaa, Oo isna xataa markuu gaboobo kama leexan doono.
**7** Taajirku masaakiintuu u taliyaa Oo kii wax amaahdaana
midiidin buu u yahay kii wax amaahiya. **8** Kii xumaan beeraa
wuxuu goosan doonaa belaayo, Oo usha cadhadiisuna way
dhammaan doontaa. **9** Kii il deeqsiya lahu wuu barakoobi
doonaa, Waayo, isagu wuxuu cuntadiisa wax ka siiyaa
masaakiinta. **10** Kan wax quudhsada eri, oo muranku wuu
bixi doonaa, Dirirta iyo cayduna way dhammaan doonaan.
**11** Kii daahirsanaanta qalbiga jecel, Oo bushimihiisu nimco
leeyihiin, xataa boqorka ayaa saaxiibkiis ahaan doona. **12**
Indhaha Rabbigu waxay dhawraan ka aqoonta leh, Laakiinse
isagu wuxuu afgembiyaa erayada khaayinka. **13** Kii caajis
ahu wuxuu yidhaahdaa, Libaax baa dibadda jooga, Oo
jidka dhexdiisa ayaa laygu dili doonaa. **14** Naago qalaad
afkoodu waa god dheer, Oo waxaa ku dhici doona kii xagga
Rabbiga laga nacay. **15** Nacasnimadu waxay ku xidhan
tahay qalbiga ilmaha. Laakiinse usha edbintu way ka fogayn
doontaa. **16** Kii miskiinka u dulma inuu maal korodhsado, Iyo
kii taajirka wax siiyaaba hubaal way baahnaan doonaan.
**17** Dhegta u dhig, oo erayada kuwa caqliga leh maqal,
Oo qalbigana aqoontayda u jeedi. **18** Waayo, waa wax
wanaagsan haddii aad uurka ku haysatid, Oo hadday
dhammaantood bushimahaaga diyaar ku ahaadaan. **19** Bal
eeg, adigaan maanta iyaga ku ogeysiiyey, Inaad Rabbiga
aaminsan tahay. **20** Miyaanan waxyaalo wanaagsan kuugu
qorin Talooyinka iyo aqoonta, **21** Si aan kuu ogeysiiyo
hubaasha erayada runta, Inaad erayada runta uga jawaabtid
kuwii ku soo diray? **22** Miskiinka ha dhicin, waayo, isagu waa
miskiin, Oo kan dhibaataysanna meesha iridda ha ku dulmin,
**23** Waayo, Rabbiga ayaa dacwadooda u qaadi doona, Oo
kuwa iyaga dhaca naftoodana wuu dhici doonaa. **24** Ha
la saaxiibin nin xanaaq badan, Oo nin cadho kululna waa
inaanad la socon, **25** Waaba intaas oo aad jidkiisa baratid,
Oo aad naftaadana dabin ku riddid. **26** Ha noqonin sida
kuwa gacanta dhaar ugu dhiiba, Ama sida kuwa deyman
u dammiinta. **27** Haddaanad haysan wax aad bixiso, Bal
muxuu sariirtaada hoostaada uga la bixi? **28** Soohdinta hore
oo ay awowayaashu dhigeen Innaba ha durkin. **29** Miyaad
aragtaa nin shuqulkiisa ku dadaala? Isagu wuxuu istaagi
doonaa boqorro hortood. Oo kuwa hoose hortoodana ma
istaagi doono.

**23** Markaad u fadhiisatid inaad taliye wax la cuntid, Aad
uga fiirso waxa hortaada yaal, **2** Oo mindi cunaha
iska saar Haddaad tahay nin hunguri weyn. **3** Cuntadiisa
macaan ha damcin, Waayo, waa cunto khiyaaneed. **4** Ha
isku daalin si aad taajir ku noqotid. Oo xigmaddaadana
ka joogso. **5** Ma waxaad indhaha ku dayaysaa wax aan
jirin? Waayo, hubaal maalku wuxuu yeeshaa baalal, Sida
gorgor samada u duula oo kale. **6** Kan isha sharka leh
kibistiisa ha cunin, Cuntadiisa macaanna ha damcin, **7**
Waayo, isagu waxaa weeye siduu qalbiga kaga fikiro; Wuxuu
kugu leeyahay, Cun oo cab, Laakiinse qalbigiisu kulama
jiro. **8** Wixii aad cuntay waad soo mantagi doontaa, Oo
erayadaadii macaanaana way kaa lumi doonaan. **9** Nacas
waxba ha kula hadlin, Waayo, isagu xigmadda hadalkaaga
wuu quudhsan doonaa. **10** Soohdintii hore ha durkin, Beeraha
agoommadana ha dhex gelin, **11** Waayo, bixiyahoodu waa
xoog badan yahay; Oo isaga ayaa dacwadooda kugu qaadi
doona. **12** Qalbigaaga edbinta u jeedi, Oo dhegahana
erayada aqoonta. **13** Ilmaha edbin ha u diidin, Waayo,
haddaad isaga ul ku garaacdid, ma dhiman doono. **14** Ul
baad isaga ku garaaci doontaa, Oo naftiisaad She'ool ka
samatabbixin doontaa. **(Sheol h7585)** **15** Wiilkaygiiyow, haddii
qalbigaagu caqli leeyahay, Qalbigayguna wuu farxi doonaa.
**16** Haah, oo xataa uurkaygu wuu rayrayn doonaa, Markay
bushimahaagu wax qumman ku hadlaan. **17** Qalbigaagu
yaanu dembilayaal ka hinaasin, Laakiinse maalinta oo dhan
Rabbiga ka cabso. **18** Waayo, hubaal waxaa jira abaalgud,
Oo rajadaaduna kaama go'i doonto. **19** Wiilkaygiiyow, i
maqal, oo caqli yeelo, Oo qalbigaagana jidka ku toosi. **20** Ha
dhex joogin khamriyacabyada Iyo kuwa hunguriweynaanta
hilibka u cuna, **21** Waayo, kii sakhraan ah iyo kii hunguri
weynuba way caydhoobi doonaan, Oo lulona nin calal bay
u xidhi doontaa. **22** Dhegayso aabbahaagii ku dhalay, Oo

hooyadaana ha quudhsan markay gabowdo. 23 Runta soo
iibso, oo ha sii iibin, Oo weliba waxaad ku sii darsataa
xigmadda iyo edbinta iyo waxgarashada. 24 Kii xaq ah
aabbihiis aad buu u farxi doonaa, Oo kii ilmo caqli leh
dhalaana farxad buu ka heli doonaa. 25 Aabbahaa iyo
hooyadaaba ha farxeen, Oo tii ku dhashayna ha rayrayso. 26
Wiilkaygiiyow, qalbigaaga i sii, Oo indhahaaguna jidadkayga
ha dhawreen. 27 Waayo, dhillo waa booraan dheer, Oo
naag qalaadna waa god cidhiidhi ah. 28 Sida tuug oo
kale ayay u gabbataa, Oo waxay dadka ku dhex badisaa
khaayinnada. 29 Bal yaa hoog leh? Oo yaa caloolxumo leh?
Oo yaa murammo leh? Oo yaa calaacal badan leh? Oo
yaa u dhaawacan sababla'aan? Oo yaa indho casaan ah
leh? 30 Waa kuwa wakhti dheer ku raaga khamriga, Waana
kuwa u taga inay doondoontaan khamri laysku daray. 31 Ha
fiirin khamrigu markuu casaado, Markuu koobka ka dhex
dhalaalo, Iyo markuu si wanaagsan u shubmayoba. 32 Ugu
dambaysta wuxuu wax u qaniinaa sida abeesada, Oo sida
jilbiskana wax buu u qaniinaa. 33 Indhahaagu waxay arki
doonaan naago qalaad, Oo qalbigaaguna wuxuu ku hadli
doonaa waxyaalo qalloocan. 34 Oo waxaad ahaan doontaa
sida kan badda dhexdeeda jiifsada, Ama sida ka dakhalka
dhaladiisa sare seexda. 35 Waxaad odhan doontaa, Wax
bay igu dhufteen, laakiin waxba ima yeelin. Way i garaaceen,
iskamana aanan garan; Bal goormaan toosi doonaa? Weli
mar kalaan doonan doonaa.

**24** Dad shar leh ha ka masayrin, Hana jeclaysan inaad
iyaga la joogtid. 2 Waayo, qalbigoodu wuxuu ka fikiraa
kharribaad, Oo bushimahooduna waxay ku hadlaan belaayo.
3 Guri wuxuu ku dhismaa xigmad, Wuxuuna ku taagnaadaa
waxgarasho, 4 Qawladuhuna aqoontay kaga buuxsamaan
Maal kasta oo qaali ah oo qurux badan. 5 Ninkii caqli lahu
xoog buu leeyahay, Oo ninkii aqoon lahuna itaal buu sii
korodhsadaa. 6 Waayo, waa inaad talo wanaagsan ku
dagaallantaa, Oo waxaa taliyayaal badan la jirta nabadgelyo.
7 Xigmaddu nacaska way ka dheer tahay, Isagu xagga
iridda afkiisa kuma kala qaado. 8 Kii ku fikira inuu xumaan
sameeyo, Waxaa loogu yeedhi doonaa belaayo-sameeye. 9
Fikirka nacasnimadu waa dembi, Kii wax quudhsadaana
waa u karaahiyo dadka. 10 Maalinta dhibaatada haddaad
liicdid, Itaalkaagu waa yar yahay. 11 Samatabbixi kuwa
dhimashada loo wadayo, Kuwa ku dhow in la gowracona dib
uga qabo. 12 Haddaad tidhaahdid, Bal eeg, waxan ma aannu
garanayn, Kan qalbiyada miisaamaa miyaanu ka fiirsanayn?
Oo kan naftaada dhawraa miyaanu ogayn? Oo miyaanu
isagu nin walba ugu abaalgudayn sida shuqulkiisu yahay?
13 Wiilkaygiiyow, malab cun, waayo, wuu wanaagsan yahay,
Oo waxaad cuntaa awlallada malabka, taas oo kuu dhadhan
macaan. 14 Oo xigmadda aqoonteeduna sidaasoo kalay
naftaada u ahaan doontaa, Oo haddaad iyada heshid waxaa
jiri doona abaalgud, Oo rajadaaduna ma go'i doonto. 15
Sida nin shar leh, ha u gabban kan xaqa ah gurigiisa, Oo
rugtiisa nasashadana ha kharribin. 16 Waayo, nin xaq ahu
toddoba goor buu dhacaa, wuuna soo sara kacaa haddana,
Laakiinse kuwa sharka leh waxaa lagu afgembiyaa belaayo.
17 Ha rayrayn markuu cadowgaagu dhaco, Oo qalbigaaguna
yaanu farxin markuu turunturoodo, 18 Waayo, waaba intaas
oo Rabbigu taas arkaa, oo ay shar la ahaato indhihiisa,
Oo uu dabadeedna cadhadiisa ka soo celiyaa isaga. 19
Xumaanfalayaasha aawadood ha isku dhibin, Kuwa sharka
lehna ha ka masayrin, 20 Waayo, kii shar leh abaalgud ma
heli doono, Oo laambadda xumaanfalayaashana waa la
bakhtiin doonaa. 21 Wiilkaygiiyow, Rabbiga iyo boqorkaba
ka cabso, Oo ha ku darsamin kuwa isrogrog badan, 22
Waayo, belaayadoodu si degdeg ah ayay u soo kici doontaa,
Oo bal yaa yaqaan baabbi'inta labadoodaba? 23 Oo
weliba waxyaalahanuna waa wixii ay kuwa caqliga lahaa
yidhaahdeen. In dadka garsooridda loogu kala eexdaa ma
wanaagsana. 24 Kii kan shar leh ku yidhaahda, Xaq baad
tahay, Dadyowga ayaa habaari doona, oo quruumuhuna way
karhi doonaan isaga, 25 Laakiinse kuwii isaga canaantaa
farxad bay yeelan doonaan, Oo dushoodana waxaa ku soo
degi doonta barako wanaagsan. 26 Kii jawaab qumman ku
jawaabaa Bushimuhuu dhunkadaa. 27 Shuqulkaaga dibadda
ku hagaajiso, Oo beerta ku diyaarso, Oo dabadeedna
gurigaaga dhiso. 28 Deriskaaga sababla'aan markhaati ha
ku furin, Oo bushimahaagana ha ku khiyaanayn. 29 Hana
odhan, Wixii uu igu sameeyey oo kale ayaan ku samayn
doonaa, Oo ninkii sidii shuqulkiisu ahaa ayaan u abaalmarin
doonaa. 30 Waxaan ag maray ninka caajiska ah beertiisa,
Iyo ninka garaadka daran beercanabkiisa, 31 Oo bal eeg,
kulligood waxaa ka baxay qodxan, Oo dhammaantoodna
waxaa qariyey maraboob, Oo derbigoodii dhagaxa ahaana
waa dumay. 32 Markaasaan eegay oo aad uga fiirsaday,
Waan fiiriyey oo wax ka bartay. 33 Weliba in yar baad
seexanaysaa, oo in yar baad gam'aysaa, Oo in yar baad
gacmaha hurdo u laabaysaa, 34 Haddaba caydhnimo waa
kuu iman doontaa sida tuug oo kale, Oo baahina sida nin
hub sita oo kale.

**25** Oo weliba kuwanuna waa maahmaahyadii Sulaymaan,
Oo boqorkii Yahuudah oo Xisqiyaah ahaa raggiisii ay
soo guuriyeen. 2 Waa u ammaan Ilaah inuu xaal qariyo,

Laakiinse waa u ammaan boqorrada inay xaal baadhaan. 3
Sida samadu u sarrayso, oo dhulkuna u gun dheer yahay,
Ayaan qalbiga boqorrada loo baadhi karin. 4 Lacagta
wasakhda ka qaad, Oo dabadeedna waxaa lacagshubaha
uga soo bixi doona weel. 5 Boqorka hortiisa kuwa sharka leh
ka fogee, Oo carshigiisuna xaqnimuu ku taagnaan doonaa.
6 Ha isweynweynayn boqorka hortiisa, Oo kuwa waaweyn
meeshoodana ha istaagin. 7 Amiirkii aad indhahaaga ku
aragtay Intii hortiisa lagu hoosaysiin lahaa, Waxaa kuu
wanaagsan iyadoo lagu yidhaahdo, Halkan sare kaalay.
8 Dirir degdeg ha ugu bixin, Waaba intaasoo aad ugu
dambaysta garan weydaa waxaad samayn lahayd, Markii
uu deriskaagu ku ceebeeyey dabadeed. 9 Dacwadaada
deriskaaga kala dood, Laakiinse mid kale xaalkiisa qarsoon
ha sheegin, 10 Waaba intaas oo uu ku caayaa kii maqlaa,
Oo aanay ceebtaadu kaa hadhin. 11 Hadalkii si hagaagsan
loogu hadlaa Wuxuu la mid yahay tufaaxyo dahab ah oo
lagu dhex sameeyey taswiiro lacag ah. 12 Kii caqli leh oo
wax canaantaa wuxuu dhegta wax maqasha oo addeecda
ula mid yahay Hilqado dahab ah iyo wax laysku sharraxo oo
dahab saafiya ah. 13 Wargeeyihii aamin ahu wuxuu kuwii
isaga soo diray ula mid yahay Qabowga barafka cad oo
wakhtiga beergooyska, Waayo, isagu wuxuu qabowjiyaa
nafta sayidyadiisa. 14 Ku alla kii hadiyad been ah isku
faaniyaa Wuxuu la mid yahay daruuro iyo dabayl aan
roob lahayn. 15 Waxaa xaakin wax lagu oggolaysiiyaa
dulqaadasho badan, Carrab macaanuna laftuu jebiyaa. 16
Malab ma heshay? In kugu filan oo keliya ka cun, Waaba
intaas oo intaad ka dheregto aad soo hunqaacdaaye. 17
Cagtaadu ha ku yaraato guriga deriskaaga, Waaba intaasoo
uu kaa daalaa oo uu ku necbaadaaye. 18 Ninkii deriskiisa
marag been ah ku furaa Waa sida budh iyo seef iyo fallaadh
af badan oo kale. 19 In wakhtiga dhibaatada nin aaminlaawe
ah laysku halleeyo Waa sida ilig jaban iyo cag murkacatay
oo kale. 20 Kii qalbi murugaysan u gabyaa Waa sida mid
maalin qabow huwiska iska qaada iyo sida khal soodhe lagu
shubo oo kale. 21 Cadowgaagu hadduu gaajaysan yahay,
wax uu cuno sii, Hadduu harraadsan yahayna waraabi, 22
Waayo, dhuxulo dab ah ayaad madaxiisa ku tuuli doontaa,
Oo Rabbiguna waa kuu abaalgudi doonaa. 23 Dabaysha
woqooyi roob bay keentaa, Sidaas oo kale carrabkii xan
badanna weji cadhaysan buu keenaa. 24 In guriga dushiisa
dhinac laga joogo ayaa ka roon In guri weyn naag muran
badan lala joogo. 25 Warkii wanaagsan oo dal fog ka
yimaadaa Waa sida biyo qabow ay naf harraadsan u yihiin
oo kale. 26 Ninkii xaq ah ee kii shar leh isu dhiibaa Waa sida
durdur qasmay iyo sida il biyood oo wasakhowday oo kale.
27 In malab badan la cunaa ma wanaagsana, Sidaas oo
kalena in ammaan la doondoontaa ammaan ma aha. 28 Kii
aan ruuxiisa u talin karinu Waa sida magaalo duntay oo aan
derbi lahayn oo kale.

**26** Sida wakhtiga kulul aan baraf cad ugu habboonayn,
oo wakhtiga beergooyska aan roob ugu habboonayn,
Ayaan sharaf nacas ugu habboonayn. 2 Sida shimbir iska
wareegaysa iyo sida dabafallaadh iska duulaysa, Ayaan
habaarkii sababla'aan ahu cidna ugu dhacayn. 3 Jeedal faras
buu ku habboon yahay, dacayna dameer, Ulina dhabarka
nacaska. 4 Nacas ha ugu jawaabin sida nacasnimadiisu
tahay, Waaba intaasoo aad sidiisa oo kale noqotaaye.
5 Nacas ugu jawaab sida nacasnimadiisu tahay, Waaba
intaasoo uu isla caqli weynaadaaye. 6 Kii nacas gacantiis
farriin u sii dhiibaa Cagahuu iska gooyaa oo khasaaruu
cabbaa. 7 Sida lugaha curyaanku u laalaadaan Ayuu
masaalkuna u yahay afka nacasyada. 8 Kii nacas sharaf
siiyaa Wuxuu la mid yahay mid wadhaf dhagax ku xidha oo
kale. 9 Sida qodaxdu u dhex gasho sakhraan gacantiis, Ayuu
masaalkuna u yahay afka nacasyada. 10 Kii nacaska ama
kuwa jidka maraya kiraystaa Waa sida qaansoole dadka
oo dhan dhaawaca oo kale. 11 Nacas nacasnimadiisa ku
noqnoqdaa Waa sida eey mantaggiisa ku noqnoqda oo
kale. 12 Nin isla caqli weyn ma aragtay? Waxaa isaga ka
rajo roon nacas. 13 Ninkii caajis ahu wuxuu yidhaahdaa,
Libaax baa waddada jooga; Libaax baa jidka taagan. 14
Sida albaabku birihiisa ugu noqnoqdo, Ayaa kii caajis ahuna
sariirtiisa isugu rogrogaa. 15 Kii caajis ahu wuxuu gacantiisa
geliyaa xeedhadiisa, Oo inuu afkiisa ku soo celiyona waa ku
dhib isaga. 16 Kii caajis ahu waa iskala caqli badan yahay
Toddoba nin oo xigmad ku jawaabi karta. 17 Kii isagoo jidka
iska maraya isku dhex dara dirir aanu waxba ku lahayn,
Wuxuu la mid yahay mid eey dhegaha qabta oo kale. 18
Sida nin waalan oo rida dab, Iyo fallaadho, iyo dhimasho,
19 Ayuu yahay kii intuu deriskiisa khiyaaneeyo, Haddana
yidhaahda, Miyaanan cayaarayn? 20 Xaabola'aanta dabku
waa bakhtiyaa, Oo meeshii aan mid xan badanu jooginna
muranku waa ka joogsadaa. 21 Sida dhuxuli raran u sii
shiddo, qoryona dab u sii belbeliyaan, Ayuu ninkii muran
badanuna dirir u sii kiciyaa. 22 Kii xan badan erayadiisu waa
sida cunto macaan, Oo waxay ku degaan meelaha caloosha
ugu hooseeya. 23 Bushimihii macaan iyo qalbigii shar lehba
Waxay la mid yihiin weel dhoobo ah oo lagu dahaadhay
lacag wasakhdeed. 24 Kii wax necebu bushimihiisuu isku
yeelyeelaa, Laakiinse uurkiisuu khiyaano ku kaydsadaa.
25 Markuu si wacan u hadlo ha rumaysan, Waayo, waxaa

qalbigiisa ku jira toddoba karaahiyo. **26** In kastoo nacaybkiisu khiyaano isku daboolo, Xumaantiisa ayaa shirka lagu hor muujin doonaa. **27** Ku alla kii bohol qodaaba isagaa ku dhex dhici doona, Oo kii dhagax giringiriyana, isaguu ku soo rogman doonaa. **28** Carrabkii been sheega wuxuu neceb yahay kuwuu dhaawacay, Oo afkii wax faaniyaana wuxuu ka shaqeeyaa baabba'.

**27** Berrito ha ku faanin, Waayo, ma ogid waxay maalinu keeni doonto. **2** Mid kale ha ku faaniyo oo yaanu afkaagu ku faanin, Shisheeye ha ku ammaano, oo yaanay bushimahaagu ku ammaanin. **3** Dhagax waa culus yahay, oo cammuuduna way miisaan weyn tahay, Laakiinse waxaa labadoodaba ka sii culus nacas cadhadiis. **4** Cadho waa naxariisdarro, xanaaqna waa daad, Laakiinse bal yaa hinaaso is-hor taagi kara? **5** Canaantii bayaan ahu Waa ka wanaagsan tahay jacaylkii qarsoon. **6** Saaxiib nabrihiisu waa daacadnimo, Laakiinse cadow dhunkashooyinkiisu waa khiyaano miidhan. **7** Naftii dheregsanu xataa awlallada malabka waa ka yaqyaqsataa, Laakiinse naftii gaajaysan wax kasta oo qadhaadhuba way u macaan yihiin. **8** Ninkii hoygiisa ka warwareegaa Waa sida shimbir buulkeeda ka warwareegta oo kale. **9** Saliidda iyo cadarku qalbigay ka farxiyaan, Sidaas oo kalena waxaa nin ka farxiya macaanka saaxiibkiis oo ka yimaada talada qalbiga. **10** Ha ka tegin saaxiibkaa iyo aabbahaa saaxiibkiis toona, Oo maalintii masiibadaadana guriga walaalkaa ha tegin, Deris kuu dhowu waa ka wanaagsan yahay walaal kaa fog. **11** Wiilkaygiiyow, caqli yeelo, oo qalbigayga ka farxi, Si aan ugu jawaabo kii i caayaba. **12** Ninkii miyir lahu sharkuu arkaa, wuuna dhuuntaa, Laakiinse garaadlaawayaashu way iska sii maraan, oo waana la taqsiiraa. **13** Kii qof qalaad dammiinta dharkiisa ka qaad, Oo kii naag qalaad dammiintana isaga rahmad ahaan u hay. **14** Kii intuu aroor hore kaco saaxiibkiis cod dheer ugu duceeya, Waxaa loo qaadan doonaa habaar. **15** Maalin roobaabeed dhibicyadeeda aan kala go'in Iyo naag muran badanu waa isku mid. **16** Ku alla kii iyada celiyaa, dabayshuu celiyaa. Gacantiisa midigna saliid bay qabataa. **17** Bir baa bir afaysa, Oo sidaas oo kale nin baa saaxiibkiis afeeya. **18** Ku alla kii berde xannaanaystaa midhihiisuu cuni doonaa. Oo kii sayidkiisa dhawrana waa la murwayn doonaa. **19** Sida fool biyaha dhexdooda fool uga muuqdo, Ayaa nin qalbigiisu nin kale ugu muuqdaa. **20** She'ool iyo halligaadu weligood ma dhergaan, Dadka indhihiisu weligood ma dhergaan. **(Sheol h7585)** **21** Weelka lacagta lagu safeeyo lacagtaa iska leh, oo foornadana dahabkaa iska leh, Sidaas oo kalena nin waxaa lagu tijaabiyaa ammaantiisa. **22** In kastoo aad nacas tib iyo mooye hadhuudh kula tuntid, Weliba nacasnimadiisu ka tegi mayso isaga. **23** Aad ugu dadaal inaad ogaatid xaalka adhigaaga, Oo lo'daadana si wanaagsan u ilaali. **24** Waayo, maalku weligiis siima raago, Taajkuna ab ka ab miyuu waaraa? **25** Cawska qallalan markii la gooyo mid cagaar ah oo jilicsan baa soo muuqda, Oo dhalatada buurahana waa la soo urursadaa. **26** Baraarku waa kuu dhar, Oo adhiguna waa kuu qiimihii beerta. **27** Waxaa jiri doona caano riyaad oo cunto ugu filan adiga iyo reerkaagaba, Iyo weliba masruufka gabdhaha kuu shaqeeya.

**28** Kuwa sharka lahu waxay cararaan iyadoo aan ciduna eryanayn, Laakiinse kuwa xaqa ahu waxay u dhiirran yihiin sida libaax oo kale. **2** Waddan xadgudubkiisa aawadiis amiirradu way badan yihiin, Laakiinse ninkii waxgarasho iyo aqoon leh dowladdiisu way sii raagtaa. **3** Miskiin masaakiinta dulmaa Waa sida roob dhulka xaadha oo aan cunto ka tegin. **4** Kuwa sharciga ka tagaa waxay ammaanaan kuwa sharka leh, Laakiinse kuwa sharciga dhawra ayaa iyaga la dirira. **5** Nimanka sharka lahu garsooridda ma gartaan, Laakiinse kuwa Rabbiga doondoonaa wax walbay gartaan. **6** Kii jidad qalloocan ku socda, in kastoo uu taajir yahay, Waxaa ka roon miskiinka daacadnimadiisa ku socda. **7** Ku alla kii sharciga dhawraa waa wiil caqli leh, Laakiinse kii raaca kuwa cirta weyn, aabbihiisuu ceebeeyaa. **8** Kii korsaar iyo ribo maalkiisa ku korodhsadaa, Wuxuu u ururin doonaa mid masaakiinta u naxariista. **9** Kii dhegtiisa ka leexiya inuu sharciga maqlo, Xataa baryootankiisu waa karaahiyo. **10** Ku alla kii kuwa xaqa ah jid shar ah ku ambiyaa, Isagaa ku dhici doona godkiisa, Laakiinse kuwa qummanu wax wanaagsan bay dhaxli doonaan. **11** Taajirku waa isla caqli weyn yahay, Laakiinse miskiinka waxgarashada leh ayaa isaga kashifa. **12** Kuwa xaqa ahu markay guulaystaan, waxaa jirta ammaan weyn, Laakiinse markii kuwa sharka lahu sara kacaan dadku waa dhuuntaa. **13** Kii xadgudubyadiisa qariyaa ma liibaani doono, Laakiinse kii qirta oo haddana ka tagaa, naxariis buu heli doonaa. **14** Ninkii mar kasta cabsadaa waa barakaysan yahay, Laakiinse kii qalbigiisa sii adkeeyaa masiibuu ku dhici doonaa. **15** Taliyihii shar lahu wuxuu dadka masaakiintaa ku yahay Sida libaax ciyaya iyo sida orso weerar ah oo kale. **16** Amiirkii garaaddaranu waa nin dulun weyn, Laakiinse kii neceb faa'iidada xaqdarrada ah cimrigiisuu dheerayn doonaa. **17** Ninkii nin dhiiggiis qabaa Wuxuu u carari doonaa godka, oo ninna yaanu ka joojin. **18** Ku alla kii si qumman u socda waa la samatabbixin doonaa, Laakiinse kii si qalloocan laba jid ugu socdaa haddiiba wuu dhici doonaa. **19** Kii dhulkiisa beertaa, cunto badan buu ka

dhergi doonaa, Laakiinse kii waxmatarayaal raacaa wuxuu
ka dhergi doonaa caydhnimo. **20** Ninkii aamin ahu aad buu
u barakoobi doonaa, Laakiinse kii taajirnimo ku degdegaa
ma taqsiir la'aan doono. **21** Ma wanaagsana in dadka loo
kala eexdo, Iyo inuu nin xabbad kibis ah u xadgudbo toona.
**22** Kii taajirnimo ku degdegaa waa qumay, Mana oga inuu
caydhoobi doono. **23** Kii nin canaantaa wuxuu marka dambe
heli doonaa Raallinimo ka badan kan carrabka ku faaniya.
**24** Kii aabbihiis ama hooyadiis wax ka dhaca oo haddana
yidhaahda, Taasu xadgudub ma aha, Wuxuu saaxiib la yahay
kii wax dumiya. **25** Kii hunguri weynu muran buu kiciyaa,
Laakiinse kii Rabbiga isku halleeya waa la barwaaqaysiin
doonaa. **26** Kii qalbigiisa isku halleeyaa waa nacas, Laakiinse
ku alla kii si caqli ah u socda waa la samatabbixin doonaa.
**27** Kii miskiinka wax siiyaa ma baahan doono, Laakiinse kii
indhaha ka qarsada aad baa loo habaari doonaa. **28** Markii
kuwa sharka lahu kacaan dadku waa dhuuntaa, Laakiinse
markay halligmaan, kuwa xaqa ahu way sii kordhaan.

**29** Kii inta wax badan la canaanto ka madax adkaadaa,
Dhaqso buu u jabi doonaa, dawona ma leh. **2** Markii
kuwa xaqa ahu amarka haystaan, dadku wuu reyreeyaa,
Laakiinse markii kuwa sharka lahu xukunka wataan, dadku
wuu taahaa. **3** Kii xigmad jecelu aabbihiisuu ka farxiyaa,
Laakiinse kii dhillooyin raacaa maalkiisuu khasaariyaa. **4**
Boqorku gar buu dalka ku dhisaa, Laakiinse kii laaluush jecelu
wuu dumiyaa. **5** Ninkii deriskiisa faaniyaa Shabag dabin ah
ayuu cagihiisa hor dhigaa. **6** Ninkii shar ah xadgudubkiisa
waxaa ku jira dabin, Laakiinse kii xaq ahu waa iska heesaa
oo reyreeyaa. **7** Kii xaq ahu wuxuu ka war hayaa dacwadda
masaakiinta, Laakiinse kii shar ahu ma yaqaan aqoontaas.
**8** Kuwa wax quudhsadaa magaalay dab qabadsiiyaan,
Laakiinse kuwa caqliga lahu cadhay qabowjiyaan. **9** Haddii
nin caqli leh nin nacas ah la doodo, Nasasho ma jirto
hadduu cadhoodo iyo hadduu qosloba. **10** Dhiigyocabyadu kii
kaamil ah way neceb yihiin, Laakiinse kuwa qumman waxay
doondoonaan inay naftiisa badbaadshaan. **11** Nacasku
cadhadiisa oo dhan buu soo saaraa, Laakiinse kii caqli lahu
dib buu u ceshadaa, wuuna aamusnaadaa. **12** Haddii taliye
been dhegaysto, Midiidinyadiisa oo dhammu waa wada shar
miidhan. **13** Miskiinka iyo khaayinku way wada kulmaan, Oo
labadoodaba Rabbigu indhahooduu iftiimiyaa. **14** Boqorkii
daacadnimo masaakiinta ugu xukuma, Carshigiisu wuu
dhisnaan doonaa weligiisba. **15** Usha iyo canaantu caqli bay
keenaan, Laakiinse ilmihii layska daayaa ceeb buu hooyadiis
u soo jiidaa. **16** Markii kuwa sharka lahu bataan, xadgudub
baa sii kordha, Laakiinse kuwa xaqa ah ayaa dhiciddooda
arki doona. **17** Wiilkaaga edbi, oo isna wuu ku nasin doonaa,
Haah, naftaada wuu ka farxin doonaa. **18** Markii aan muujinu
jirin dadku waa halligmaa, Laakiinse kii sharciga dhawraa
waa barakaysan yahay. **19** Addoon hadal kuma edeb yeesho,
Waayo, in kastoo uu garanayo ka jawaabi maayo. **20** Ma
aragtay nin hadalkiisa ku degdega? Kaas waxaa ka rajo roon
nacas. **21** Kii addoonkiisa si wanaagsan u soo koriya tan
iyo yaraantiisa, Ugu dambaysta wiil buu u noqon doonaa.
**22** Ninkii xanaaq badanu muran buu kiciyaa. Ninkii cadho
kululuna xadgudub buu badsadaa. **23** Nin kibirkiisu hoos
buu u dejin doonaa, Laakiinse kii is-hoosaysiiyaa sharaf
buu heli doonaa. **24** Ku alla kii tuug la shirkoobaa naftiisuu
nacaa, Habaarkuu maqlaa, laakiinse waxba kama sheego.
**25** Dadka ka cabsashadiisu wax bay dabtaa, Laakiinse kii
Rabbiga isku halleeyaa wuu nabad geli doonaa. **26** Kuwo
badan baa taliyaha raallinimo ka doona, Laakiinse dadka
garsooriddiisu waxay ka timaadaa xagga Rabbiga. **27** Ninkii
xaqdaranu waa u karaahiyo kuwa xaqa ah, Oo kii jidka ku
qummanuna waa u karaahiyo kii shar ah.

**30** Kuwanu waa erayadii Aaguur ina Yaaqeh, oo ahaa reer
Masaa. Ninku wuxuu la hadlay Iitii'eel, iyo xataa Iitii'eel
iyo Ukaal, oo ku yidhi, **2** Hubaal anigu waan ka doqonnimo
weynahay nin kastaba, Oo dad waxgarashadiisana ma lihi.
**3** Xigmad ma aan baran, Aqoonta Kan quduuska ahna ma
aqaan. **4** Yaa samada u baxay, oo ka soo degay? Yaa
dabaysha gacmihiisa ku soo ururshay? Yaa biyaha dharkiisa
ku guntay? Yaa dhulka darafyadiisa oo dhan dhisay? Magicii,
wiilkiisana magicii, haddaad taqaan? **5** Eray kasta oo Ilaah
waa daahir; Oo isagu wuxuu gaashaan u yahay kuwa isaga
aaminsan. **6** Erayadiisa waxba ha ku darin, Waaba intaas oo
uu ku canaantaa, oo lagu ogaadaa inaad beenaaleh tahay.
**7** Laba waxyaalood ayaan ku weyddiistay, Iyaga ha ii diidin
intaanan dhiman. **8** Wax aan waxtar lahayn iyo been iga
fogee, Oo caydhnimo iyo taajirnimo midna ha i siin. Igu
quudi cunto aanan ka maarmin, **9** Waaba intaasoo intaan
dhergo, aan adiga ku inkiraaye, oo aan idhaahdaa, Waa ayo
Rabbigu? Amase waaba intaasoo aan miskiin noqdaa, oo
intaan wax xado, Aan magaca Ilaahayga si been ah ugu
hadal qaadaaye. **10** Addoon sayidkiisa xan ha uga sheegin,
Waaba intaas oo uu ku habaaraa, oo eed lagugu helaaye. **11**
Waxaa jira farcan aabbahood inkaara, Oo aan hooyadoodna
u ducayn. **12** Waxaa jira farcan isla daahirsan, Oo weliba aan
nijaastoodii ka maydhmin. **13** Waxaa jira farcan indhahoodu
aad u sarreeyaan! Oo daboolka indhahoodana kor bay u
qaadaan. **14** Waxaa jira farcan ilkahoodu sida seefo oo kale
yihiin, oo gowsahooduna sida mindiyo oo kale yihiin, Si ay

masaakiinta dhulka uga baabbi'iyaan, oo ay kuwa baahanna
dadka dhexdiisa uga dhammeeyaan. **15** Culaacushu waxay
leedahay laba gabdhood, oo leh, Na sii, Na sii. Waxaa
jira saddex waxyaalood oo aan weligood dhergin, Haah,
oo afar aan odhan, Bes, nagu filan; **16** Waxaana weeye
qabriga, iyo maxalka aan wax dhalayn, Iyo dhulka aan biyo
ka dhergayn, Iyo dabka aan odhan, Bes, igu filan. **(Sheol
h7585)** **17** Isha aabbaheed ku majaajiloota, Oo quudhsata inay
hooyadeed addeecdo, Waxaa la soo bixi doona tukayaasha
dooxada, Oo waxaa cuni doona gorgorrada. **18** Waxaa jira
saddex waxyaalood oo anigu aan aad ula yaabo, Haah,
afar baan garan waayay, **19** Oo iyana waxaa weeye siduu
gorgor hawada u duulo, Siduu masna dhagax ugu socdo,
Siday doonnina badda u maaxdo, Iyo siduu nin gabadh ula
macaamiloodo. **20** Sidaas oo kale waxaa ah naag dhillo ah
sideeda, Taasoo intay wax cunto afka tirtirta, Oo haddana
tidhaahda, Anigu waxba xumaan ma aan samayn. **21** Saddex
waxyaalood ayaa dhulku la gariiraa, Oo afar baanu qaadan
karin, **22** Waxaana weeye addoon markuu boqor noqdo, Iyo
nacas markuu cunto ka dhergo, **23** Iyo naag la nacay markay
guursato, Iyo gabadh addoon ahu markay sayidaddeedii
meesheeda gasho. **24** Waxaa jira afar waxyaalood oo
dhulka ku yaryar, Laakiinse aad iyo aad u caqli badan. **25**
Qudhaanjadu waa sida dad aan xoog badnayn, Laakiinse
waxay cuntadooda soo diyaarsadaan guga. **26** Walooyinku
waa qoon taagdaran, Oo haddana waxay guryahooda ka
samaystaan dhagaxyada dhexdooda; **27** Ayaxu boqor ma
leh, Weliba dhammaantood guuto guuto ayay u socdaan.
**28** Qorratadu waa wax gacanta lagu qaban karo, Weliba
waxay joogtaa guryaha boqorrada. **29** Waxaa jira saddex
waxyaalood oo si fiican u socda, Haah, oo afar waa socod
wanaagsan yihiin. **30** Aar libaax oo ah kan xayawaanka ugu
xoogga badan, Oo aan weliba midna dib uga noqon, **31**
Diiqa xarragoonaya, iyo orgiga; Iyo boqorka aanay dadku
gees ka ahayn. **32** Haddaad nacasnimo samaysay adoo isa
sarraysiinaya, Ama aad wax shar ah ka fikirtay, Gacanta afka
saar. **33** Waayo, caanihii la lulaa subag bay soo saaraan,
Sankii la maroojiyaana dhiig buu keenaa, Sidaas oo kalena
cadhadii la qasbaa dirir bay keentaa.

**31** Kuwanu waa erayadii Lemuu'eel oo ahaa boqorkii
Masaa ay hooyadiis bartay isaga. **2** Waa maxay,
wiilkaygiiyow? Waa maxay, wiilkii uurkaygow? Waa maxay,
wiilkii nidarradaydow? **3** Xooggaaga naago ha siinin,
Dawyadaadana ha siinin kuwa boqorrada dumiya. **4**
Lemuu'eelow, uma eka boqorrada, uma eka boqorradu inay
khamri cabbaan, Oo amiirradana uma eka inay waxa lagu
sakhraamo damcaan, **5** Waaba intaasoo ay cabbaan, oo
ay sharciga illoobaan, Oo ay kuwa dhibaataysan midkood
gartiisa qalloociyaan. **6** Waxa lagu sakhraamo siiya ka
dhimashada ku dhow, Oo khamrigana waxaad siisaan kuwa
naftoodu la qadhaadhaatay. **7** Ha cabbo, oo caydhnimadiisa
ha illoobo, Oo dhibaatadiisana yaanu mar dambe soo
xusuusan innaba. **8** Afka u fur carrablaawaha aawadiis, Si
aad kuwa baabba'aya oo dhan u xaq mariso. **9** Afka fur, oo
si xaq ah u garsoor, Oo miskiinka iyo saboolka baahanba
gartooda u qaad. **10** Bal yaa heli kara naag wanaagsan?
Waayo, qiimaheedu waa ka sii badan yahay xataa luul. **11**
Waayo, qalbiga ninkeedu iyaduu isku halleeyaa, Oo isagu
innaba uma baahnaan doono wax booli ah. **12** Cimrigeeda
oo dhan isaga wanaag bay u samayn doontaa, Oo innaba
xumaan kuma samayn doonto. **13** Waxay doondoontaa
dhogor idaad iyo geed linen la yidhaahdo. Oo iyadoo
raalli ku ah ayay gacmaheeda ku shaqaysaa. **14** Iyadu
waa sida doonniyaha baayacmushtariga, Oo cuntadeeda
waxay ka keentaa meel fog. **15** Waxay kacdaa iyadoo weli
ay habeennimo tahay, Oo dadka reerkeeda ayay cunto
siisaa, Oo gabdhaheedana hawshooday siisaa, **16** Iyadu
waxay ka fikirtaa beer, wayna soo iibsataa, Oo midhaha
gacmaheeda ayay beercanab ku beerataa. **17** Waxay dhexda
ku xidhataa xoog, Oo gacmaheedana way xoogaysaa.
**18** Waxay eegtaa in baayacmushtarigeedu wanaagsan
yahay; Laambaddeeduna habeenkii ma bakhtido. **19** Waxay
gacmaheeda ku fidisaa dunmiiqa, Oo sacabbadeeduna
waxay qabtaan usha wareegta. **20** Waxay sacabkeeda
u furtaa miskiinka, Oo gacmaheedana waxay u fidisaa
saboolka baahan. **21** Dadka reerkeeda ugama cabsato
dhaxanta barafka cad, Waayo, xaaskeeda oo dhammu waxay
wada qabaan dhar labanlaab ah. **22** Waxay samaysataa
durraaxado daabac leh, Oo dharkeeduna waxaa weeye
dhar aad u wanaagsan oo guduudan. **23** Ninkeedana
waxaa laga yaqaan irdaha magaalada, Markuu dhex
fadhiisto waayeellada waddanka. **24** Waxay samaysaa dhar
wanaagsan, wayna iibisaa, Oo baayacmushtarigana waxay
ka iibisaa boqorro dhexda lagu xidho. **25** Xoog iyo sharaf
ayaa iyada dhar u ah; Oo wakhtiga soo socda way ku
qososhaa. **26** Afkeeda waxay u kala qaaddaa xigmad; Oo
carrabkeedana waxaa saaran sharciga raxmadda. **27** Waxay
aad u xannaanaysaa reerkeeda, Oo kibista caajisnimadana
ma cunto. **28** Carruurteedu way kacaan oo waxay ugu
yeedhaan tan barakaysan, Oo weliba ninkeeduna wuu
ammaanaa, isagoo leh; **29** Dumar badan baa wanaag
sameeyey, Laakiinse adigu waad ka sii wanaagsan tahay
dhammaantood. **30** Suuradwacnaantu waa khiyaano miidhan,

oo quruxduna waa ceeryaamo oo kale, Laakiinse naagtii
Rabbiga ka cabsata waa la ammaani doonaa. 31 Midhihii
gacmaheeda wax ka siiya, Oo shuqulladeeduna iyada ha ku
ammaaneen irdaha magaalada.

# Wacdiyahii

**1** Kuwanu waa erayadii wacdiyihii ahaa ina Daa'uud oo
Yeruusaalem boqorka ku ahaa. **2** Wacdiyuhu wuxuu
leeyahay, Waa wax aan waxba tarayn, waa wax aan waxba
tarayn, wax waluba waa wax aan waxba tarayn. **3** Bal
maxaa faa'iido ah oo nin ka hela hawshiisa uu qorraxda
hoosteeda ku hawshoodo oo dhan? **4** Qarni baa taga, oo
qarni kalena wuu yimaadaa, laakiinse dhulku weligiisba wuu
waaraa. **5** Oo qorraxduna way soo baxdaa, oo haddana
way dhacdaa, oo waxay ku degdegtaa meeshii ay ka soo
baxdo. **6** Dabayshu waxay tagtaa xagga koonfureed, oo
haddana waxay u soo rogmataa xagga woqooyi, oo had
iyo goorba way wareegtaa, oo dabayshu waxay ku soo
noqotaa wareeggeedii. **7** Webiyaasha oo dhammu waxay
ku shubmaan badda, oo weli badduna ma buuxsanto, oo
webiyaashu meeshii ay ku socdaan ayay haddana ku sii
socdaan. **8** Wax kastaaba waa daal miidhan, dadku ma
sheegi karo innaba. Ishu wax arag kama dheregto, dhegtuna
waxmaqlid kama buuxsanto. **9** Wixii hore u jiri jiray waa waxa
dibna u jiri doona, oo wixii la sameeyeyna waa waxa hadda
ka dib la samayn doono, oo inta qorraxda ka hoosaysana
wax cusub laguma arko. **10** Miyey jiraan wax la odhan karo,
Bal eeg, waxanu waa cusub yihiine? Way jiri jireen tan iyo
waayihii inaga horreeyey. **11** Waxyaalihii hore lama xusuusto,
oo waxyaalaha iman doonana innaba laguma xusuusan
doono kuwa dabadeed iman doona. **12** Anigan wacdiyaha
ahu boqor baan reer binu Israa'iil ugu ahaa Yeruusaalem.
**13** Oo waxaan qalbigayga oo dhan u soo jeedshay inaan
doono oo xigmad ku baadho waxyaalaha samada hoosteeda
lagu sameeyo oo dhan. Dhibaatadan kulul ayaa Ilaah binu-
aadmigu u siiyey inay ku hawshoodaan. **14** Shuqullada
qorraxda hoosteeda lagu sameeyo oo dhan waan arkay, oo
bal eeg, dhammaantood waa wax aan waxba tarayn iyo
dabagalka dabaysha oo kale. **15** Wixii qalloocan lama toosin
karo, oo wixii dhimmanna lama tirin karo. **16** Qalbigaygaan
la hadlay, oo waxaan ku idhi, Bal eeg, anigu waxaan helay
xigmad ka sii badan tii kuwii hortaydii Yeruusaalem u talin
jiray oo dhan, oo qalbigaygu aad buu u arkay xigmad badan
iyo aqoon dheer. **17** Waxaan qalbigayga siiyey inaan xigmad
ogaado iyo inaan waalli iyo nacasnimo ogaado, oo waxaan
gartay inay taasuna tahay dabagalka dabaysha oo kale. **18**
Waayo, xigmaddii badan caloolxumo badan baa ku jirta, oo
kii aqoon korodhsadaana murug buu sii korodhsadaa.

**2** Waxaan qalbiga iska idhi, Bal kaalay, waxaan kugu
tijaabin doonaa farxad, haddaba bal iska raaxayso, oo
bal eeg, taasuna waa wax aan waxba tarayne. **2** Qosol
waxaan ka idhi, Waa waalli! Farxadna waxaan ka idhi, Bal
maxay taraysaa? **3** Waxaan qalbigayga ka damcay inaan
jidhkayga khamri ku istareexiyo intii qalbigaygu xigmad igu
hoggaaminayo, iyo inaan nacasnimo xagsado jeeraan arko
waxa binu-aadmiga ku wanaagsan inay cimrigooda oo dhan
samada hoosteeda ku sameeyaan. **4** Waxaan samaystay
shuqullo waaweyn, guryana waan dhistay, beero canab ahna
waan beertay. **5** Waxaan samaystay beero iyo firdows, oo
waxaan ku dhex beeray geed midho cayn kastaba leh. **6**
Waxaan samaystay balliyo biya ah oo laga waraabiyo kaynta
dhirtu ka baxdo. **7** Waxaan soo iibsaday addoommo rag
iyo dumarba ah, oo waxaan lahaa addoommo gurigayga
ku dhashay, weliba waxaan lahaa hanti aad u badan oo
ishkin iyo adhiba leh, oo waan ka sii hodansanaa kuwii
Yeruusaalem iiga horreeyey oo dhan. **8** Oo weliba waxaan
kaloo soo urursaday lacag, iyo dahab, iyo khasnado khaas
ah oo ay boqorro iyo gobollo leeyihiin. Oo waxaan yeeshay
niman ii gabya iyo naago ii gabya, iyo waxyaalaha ay binu-
aadmigu ku farxaan iyo dumar badan. **9** Sidaasaan u weynaa
oo uga maal badnaa kuwii Yeruusaalem iiga horreeyey oo
dhan, oo weliba xigmaddaydiina way igu hadhay. **10** Oo
wax kasta oo indhahaygu jeclaysteenna kama aan celin, oo
qalbigaygana kama aan joojin farxad cayn kastoo ay tahayba,
waayo, qalbigaygu wuu ku reyreeyey hawshaydii oo dhan,
oo taasuna waxay ahayd qaybtii aan hawshaydii oo dhan ka
helay. **11** Markaasaan fiiriyey shuqulladii ay gacmahaygu
sameeyeen oo dhan, iyo hawshii aan ku hawshooday oo
dhan, oo bal eeg, dhammaantood waxay ahaayeen wax
aan waxba tarayn iyo dabagalka dabaysha oo kale, oo
innaba faa'iido laguma arag inta qorraxda ka hoosaysa.
**12** Markaasaan u soo jeestay inaan xigmad iyo waalli iyo
nacasnimoba fiiriyo, waayo, ninka boqorka ka dambeeya bal
muxuu samayn karaa wixii hore loo sameeyey mooyaane?
**13** Markaasaan gartay in xigmaddu ay ka sii fiican tahay
nacasnimada, sida iftiinku uu gudcurka uga fiican yahay
oo kale. **14** Ninkii xigmadda leh indhihiisu madaxiisay ku
yaallaan, oo nacasku gudcur buu ku dhex socdaa, laakiinse
waxaan gartay inuu isku wax dhammaantood ku dhoco. **15**
Oo haddana waxaan qalbigayga iska idhi, Wixii nacaska
ku dhaca anigana way igu dhici doonaan, haddaba bal
maxaan uga xigmad badnaaday? Markaasaan qalbigayga
iska idhi, Taasuna waa wax aan waxba tarayn. **16** Waayo,
kan xigmadda leh lama xusuusto ilaa weligiis xataa sida
aan nacaska loo xusuusan, maxaa yeelay, wakhtiga soo
socda waxa haatan jooga oo dhan waa la wada illoobi
doonaa. Oo bal kan xigmadda lahu wuxuu u dhintaa sida

nacaska oo kale! **17** Sidaas daraaddeed nolosha waan
nacay, maxaa yeelay, shuqulka qorraxda hoosteeda lagu
sameeyo oo dhammu dhib buu ii ahaa, waayo, kulli waa wax
aan waxba tarayn iyo dabagalka dabaysha. **18** Wixii aan
qorraxda hoosteeda ku hawshooday oo dhan waan nacay,
maxaa yeelay, waa inaan uga tago ninka iga dambeeya.
**19** Bal yaase yaqaan inuu ahaan doono nin xigmad leh
amase nacas? Kolleyse isagaa u talin doona hawshaydii
aan qorraxda hoosteeda ku hawshooday oo aan xigmad ku
muujiyey oo dhan. Taasuna waa wax aan waxba tarayn. **20**
Haddaba sidaas daraaddeed ayaan uga qalbi jabay wixii aan
qorraxda hoosteeda ku hawshooday oo dhan. **21** Waayo,
waxaa jira nin hawshiisa xigmad, iyo aqoon, iyo guul ku
sameeya, oo haddana uga taga nin aan ku hawshoon.
Taasuna waa wax aan waxba tarayn iyo xaqdarro. **22** Bal
maxaa nin ka helaa hawshiisa uu qorraxda hoosteeda ku
hawshoodo oo dhan iyo dabagalka qalbigiisaba? **23** Waayo,
maalmihiisa oo dhammu waa u murug, dhibaatadiisuna waa
u tiiraanyo, oo xataa habeenkii qalbigiisu ma nasto. Taasuna
waa wax aan waxba tarayn. **24** Nin inuu wax cuno oo wax
cabbo oo uu hawshiisa si wanaagsan ugu raaxaysto wax
uga roon lama arko, oo taasna waxaan arkay inay tahay
wax gacanta Ilaah ka yimid. **25** Waayo, bal yaa wax cuni
kara, yaase raaxaysan kara in iga badan? **26** Waayo, qofkii
Ilaah ka farxiyo wuxuu siiyaa xigmad iyo aqoon iyo farxad,
laakiinse dembilaha wuxuu siiyaa dhib inuu wax u ururiyo oo
uu taallaysto si uu u siiyo kan Ilaah ka farxiya. Taasuna waa
wax aan waxba tarayn iyo dabagalka dabaysha oo kale.

**3** Wax kastaaba waxay leeyihiin wakhti u khaas ah, wax
kasta oo samada ka hooseeyaaba waxay leeyihiin wakhti
go'an. **2** Waxaa jira wakhti la dhasho, iyo wakhti la dhinto;
wakhti wax la beero, iyo wakhti wixii la beeray la gurto; **3**
wakhti wax la dilo, iyo wakhti wax la bogsiiyo; wakhti wax
la dumiyo, iyo wakhti wax la dhiso; **4** wakhti la ooyo iyo
wakhti la qoslo; wakhti la baroorto, iyo wakhti la cayaaro;
**5** wakhti dhagaxyo la xooro, iyo wakhti dhagaxyo la soo
ururiyo; wakhti laysku duubo, iyo wakhti iskuduubidda la
daayo; **6** wakhti wax la doondoono, iyo wakhti wax la lumiyo;
wakhti wax la sii haysto iyo wakhti wax la xooro; **7** wakhti
wax la jeexjeexo, iyo wakhti wax la tolo; wakhti la aamuso
iyo wakhti la hadlo; **8** wakhti wax la jeclaado iyo wakhti wax
la necbaado; wakhti dagaaleed, iyo wakhti nabdeed. **9** Kii
shaqeeyaa bal maxaa faa'iido ah oo uu ka helaa hawshiisa
uu ku hawshoodo? **10** Dhibaatadii Ilaah binu-aadmiga u
siiyey inay ku hawshoodaan ayaan arkay. **11** Wax kastuu
ka dhigay inay wakhtigooda quruxsanaadaan, oo haddana
daa'imnimadii ayuu qalbigooda ku beeray, hase ahaatee
binu-aadmigu ma uu garto shuqulkii Ilaah sameeyey tan iyo
bilowgii ilaa ugudambaysta. **12** Waan ogahay inaan binu-
aadmigu lahayn wax uga wanaagsan inay iska farxaan oo
ay cimrigooda oo dhan wanaag sameeyaan mooyaane. **13**
Oo weliba waa hibo Ilaah in nin kastaaba wax cuno oo wax
cabbo, oo uu wanaag ku istareexo intuu hawshoodo oo dhan.
**14** Waxaan ogahay in wax kasta oo Ilaah sameeyaaba ay
weligood sii raagayaan. Waxba laguma dari karo, waxbana
lagama dhimi karo. Oo Ilaah wuxuu saas u yeelay in dadku
ka cabsado. **15** Waxa haatan jiraa horeba way u jireen,
oo waxa jiri doonaana horeba way u jireen, oo Ilaahna
wuxuu doondoonaa wixii hore u dhaafay. **16** Weliba waxaan
kaloo qorraxda hoosteeda ku arkay in meeshii garsooridda
ay caddaaladdarro ku jirto, oo meeshii xaqnimadana ay
xumaanu ku jirto. **17** Waxaan qalbigayga iska idhi, Ilaah
baa u kala garsoori doona kan xaqa ah iyo kan sharka ah,
waayo, wax kasta iyo shuqul kastaaba halkaasay wakhti
ku leeyihiin. **18** Waxaan qalbigayga iska idhi, Waxaa Ilaah
doonaya inuu binu-aadmiga u tijaabiyo inay ogaadaan inay
xayawaan yihiin. **19** Waayo, wixii binu-aadmiga ku dhacaaba
xayawaankana way ku dhacaan, oo xataa isku wax baa ku
dhaca, oo sidii midkood u dhinto ayaa kan kalena u dhinta,
oo weliba dhammaantood waxay leeyihiin isku neef, oo
dadku xayawaanka waxba ma dheera, waayo, wax kastaaba
waa wax aan waxba tarayn. **20** Kulli isku meel bay tagaan,
oo kulligood ciiddaa laga abuuray, oo kulligoodna ciidday ku
wada noqon doonaan. **21** Waayo, bal yaa yaqaan in dadka
naftiisu ay kor tagto iyo in xayawaanka naftiisu ay dhulka
hoos u tagto iyo in kale? **22** Haddaba sidaas daraaddeed
waxaan ogaaday inaan dadka wax u dhaama la arag in nin
kasta shuqulladiisa ku farxo mooyaane, waayo, taasu waa
qaybtiisii, maxaa yeelay, bal yaa isaga dib u soo celinaya
inuu arko waxa dabadiis ahaan doona?

**4** Markaasaan mar kale soo fiirsaday waxyaalaha dulmiga
ah ee qorraxda hoosteeda lagu sameeyo oo dhan, oo
waxaan fiiriyey kuwa la dulmay ilmadoodii, oo mid u qalbi
qabowjiyana ma ay lahayn. Kuwii iyaga dulmayay dhankooda
xoog baa jiray, laakiinse iyagu qalbiqabowjiye ma ay lahayn.
**2** Sidaas daraaddeed waxaan ammaanay kuwii dhintay in
ka sii badan kuwa haatan jooga ee weli nool. **3** Oo weliba
waxaa labadoodaba ka wanaagsan kan aan weli dhalan
oo aan arag shuqulka sharka ah oo qorraxda hoosteeda
lagu sameeyo. **4** Oo haddana waxaan arkay in hawl oo
dhan iyo shuqul kasta oo lagu guulaystoba uu nin deriskiisu
ugu hinaaso. Oo taasuna waa wax aan waxba tarayn iyo
dabagalka dabaysha oo kale. **5** Nacasku gacmihiisuu isku

duudduubaa, oo wuxuu cunaa hilibkiisa. 6 Sacab muggiis
oo xasilloonaan lagu helo ayaa ka wanaagsan laba sacab
oo hawl iyo dabagalka dabaysha lagu helo. 7 Oo haddana
waxaan qorraxda hoosteeda ku fiirsaday wax aan waxba
tarayn. 8 Waxaa jira mid keligiis ah oo uusan mid labaadna
wehelin, oo aan wiil iyo walaal toona lahayn. Hawshiisa
oo dhammu dhammaad ma leh, oo indhihiisuna taajirnimo
kama dhergaan. Oo wuxuu isku yidhaahdaa, Bal yaan u
hawshoonayaa, yaanse naftayda waxyaalo wanwanaagsan
ugu diidayaa? Taasuna waa wax aan waxba tarayn, waana
dhib aad u xun. 9 Laba waa ka wanaagsan yihiin mid qudha,
maxaa yeelay, abaalgud wanaagsan bay hawshooda ka
helaan. 10 Waayo, hadday dhacaan, mid ba wadaygiis sare u
qaadi doona, laakiinse waxaa iska hoogay kii markuu dhaco
keligiis ah, oo aan lahayn mid kale oo sare u qaada. 11 Oo
haddana haddii laba wada seexdaan way iskululeeyaan,
laakiinse sidee baa mid keligiis ahu u kululaan karaa? 12 Oo
hadduu nin ka adkaado mid keligiis ah kolley laba way hor
joogsan doonaan. Xadhig saddex qaybood laysugu soohay
dhaqso uma kala go'o. 13 Boqor nacas ah oo gaboobay oo
aan innaba mar dambe talo qaadan waxaa ka wanaagsan
barbaar miskiin ah oo xigmad leh. 14 Waayo, xabsi buu
uga soo baxay inuu boqor noqdo, oo boqortooyadiisuu ku
dhex dhashay isagoo miskiin ah. 15 Waxaan arkay inta nool
ee qorraxda hoosteeda socota oo dhan iyagoo la jooga
barbaarka meeshiisa istaagi doona. 16 Dadka uu isagu u
taliyey oo dhammu dhammaad ma lahayn, laakiinse kuwa
isaga ka daba iman doonaa kuma rayrayn doonaan isaga.
Hubaal taasuna waa wax aan waxtar lahayn iyo dabagalka
dabaysha oo kale.

5 Markaad guriga Ilaah tegaysid is-ilaali, waayo, inaad u
dhowaatid si aad wax u maqashid way ka roon tahay
inaad bixisid allabariga nacasyada oo kale, maxaa yeelay,
iyagu ma oga inay wax shar ah samaynayaan. 2 Afkaaga ha
ku degdegin, oo inaad Ilaah hortiisa wax kaga hadashid ha u
dhaqsan, waayo, Ilaah samaduu joogaa, adna dhulkaad
joogtaa, haddaba hadalkaagu ha yaraado. 3 Waayo, riyo
waxay ka dhalataa hawl badan, oo nacaska codkiisana
waxaa lagu gartaa hadalkiisa badan. 4 Markaad Ilaah nidar
u nidartid waa inaadan inaad bixisid dib uga dhicin, waayo,
isagu nacasyada kuma farxo ee wixii aad u nidartay bixi. 5
Inaad nidar gasho oo aadan bixin waxaa ka wanaagsan
inaadan waxba nidrin. 6 Afkaaga ha u oggolaan inuu
jidhkaaga dembaajiyo, oo malaa'igta horteedana ha ka
odhan, Qalad bay ahaayeen. Bal maxaad Ilaah codkaaga
ugu cadhaysiisaa si uu shuqulka gacmahaaga u baabbi'iyo?
7 Waayo, riyooyin iyo erayo fara badanba waxaa ku jira
wax badan oo aan waxtar lahayn, laakiinse adigu Ilaah ka
cabso. 8 Haddaad gobol ku aragtid masaakiin la dulmayo,
iyo garsoorid iyo caddaalad si xoog leh loo qalloocinayo,
waxaas ha la yaabin, waayo, kan sare mid ka sii sarreeya
ayaa eegaya, oo weliba waxaa jira kuwa ka sii sarreeya
iyaga. 9 Dhulka faa'iidadiisu kulli way ka dhexaysaa, waayo,
boqorka qudhiisaba waxaa looga adeegaa beerta. 10 Kii
lacag jecelu lacag kama dhergi doono, oo kii maal badan
jeceluna faa'iido kama dhergi doono, taasuna waa wax aan
waxba tarayn. 11 Markii maalku bato kuwa cunaana way sii
bataan. Maalku bal muxuu kan leh u taraa inuu indhihiisa ku
fiiriyo mooyaane? 12 Ninkii hawshooda hurdadiisu waa u
macaan tahay, hadduu wax yar cuno iyo hadduu wax badan
cunoba, laakiinse taajirka maalkiisa badanu hurdaduu u
diidaa. 13 Waxaa jira wax shar ah oo aad u xun oo aan
qorraxda hoosteeda ku arkay, waana maal badan oo uu
kan lahu sii haysto oo uu waxyeello uun isu keeno. 14 Oo
maalkaasu wax xun buu ku baabba'aa, oo kii lahaana wiil
buu dhalay, laakiinse gacantiisa waxba kuma jiraan. 15
Siduu uurka hooyadiis uga soo baxay ayuu isagoo qaawan
ku tegi doonaa, siduu hore ku yimid oo kale. Oo hawshiisa
aawadeedna wax uu gacanta ku qaadan karo ma qaadan
doono. 16 Oo weliba taasuna waa wax aad u xun inuu si
kastaba ku tago siduu hore ku yimid oo kale; haddaba kan
dabayl ku hawshooda bal maxaa faa'iido ah oo uu helayaa?
17 Oo weliba cimrigiisa oo dhan wuxuu ku cunaa gudcur, oo
intaasna wuxuu ku jiraa murug, iyo cudur, iyo cadho. 18
Bal eeg, waxaan gartay inay wanaagsan tahay oo habboon
tahay in qof wax cuno oo wax cabbo, iyo inuu hawshiisa uu
qorraxda hoosteeda ku hawshoodo oo dhan ku istareexo
cimrigii Ilaah siiyey oo dhan, waayo, taasu waa qaybtiisa.
19 Oo weliba nin kasta oo Ilaah maal iyo hanti siiyey, oo
haddana siiyey karti uu wax kaga cuno, oo uu kaga qayb
qaato, iyo inuu hawshiisa ku reyreeyoba, taasu waa hibo
Ilaah. 20 Waayo, isagu aad uma xusuusan doono wakhtigii
uu noolaa, maxaa yeelay, Ilaah baa farxad qalbigiisa geliya.

6 Waxaa jira wax xun oo aan qorraxda hoosteeda ku
arkay, taasuna waa wax dadka ku culus, 2 waana nin
Ilaah siiyey maal, iyo hanti, iyo sharaf, oo wax alla wixii
naftiisu jeceshahayna aan waxba ka dhinnayn, oo haddana
Ilaah isaga aan siin karti uu wax kaga cuno, laakiinse uu
shisheeye iska cuno. Taasu waa wax aan waxba tarayn iyo
dhibaato xun. 3 Haddii nin boqol carruur ah dhalo, oo uu
sannado badan noolaado si uu u cimri dheeraado, laakiinse
ayan naftiisu wax wanaagsan ka dhergin, oo haddana aan
la aasin, waxaan leeyahay, Kaas waxaa ka wanaagsan

dhicis. 4 Waayo, dhicisku wax aan waxba tarayn ayuu u
yimaadaa, gudcur buuna ku tagaa, oo magiciisana gudcur
baa daboola. 5 Oo weliba qorraxda ma uu arag, mana
garan, oo kaasu waa ka sii nasasho badan yahay kii kale. 6
In kastoo uu noolaado kun sannadood oo laba jibbaar ah,
laakiinse uusan wax wanaagsan ku raaxaysan, sow kulliba
isku meel lama wada tago? 7 Nin hawshiisa oo dhan waa u
afkiisaa, laakiinse kama hamuun beelo. 8 Waayo, bal kii
xigmad lahu maxaa faa'iido ah oo uu nacaska dheer yahay?
Miskiinkii kuwa nool hortooda si loogu socdo yaqaanse,
maxaa faa'iido ah oo uu leeyahay? 9 Damac iska wareega
waxaa ka wanaagsan indhaha aragtiddooda, taasuna waa
wax aan waxba tarayn iyo dabagalka dabaysha oo kale. 10
Nin waluba wuxuu yahayba waa horaa loo magacaabay, oo
waa la garanayaa inuu binu-aadmi yahay, oo lamana uu
diriri karo kan isaga ka xoog badan. 11 Waxaa jira waxyaalo
badan oo sii kordhiya waxa aan waxba tarayn, bal maxaa
faa'iido ah oo uu binu-aadmigu leeyahay? 12 Waayo, bal yaa
garanaya waxa qof u wanaagsan intuu nool yahay oo ah
maalmihii cimrigiisa aan waxba tarayn oo dhan ee uu sida
hoos oo kale u dhaafiyo? Waayo, bal yaa nin u sheegi kara
waxa qorraxda hoosteeda isaga dabadiis ahaan doona?

**7** Magac wanaagsanu waa ka sii fiican yahay saliid qaali ah,
oo maalinta dhimashaduna waa ka fiican tahay maalinta
dhalashada. 2 In guriga diyaafadda la tago waxaa ka
wanaagsan in guriga baroorashada la tago, waayo, taasaa
dadka oo dhan u dambaysa, oo kuwa nooluna qalbigay
taas gashan doonaan. 3 Qosol waxaa ka wanaagsan
murug, waayo, qalbigu wuxuu ku wanaagsanaadaa wejiga
caloolxumadiisa. 4 Qalbiga kuwa xigmadda lahu wuxuu
ku jiraa guriga baroorashada, laakiinse qalbiga nacasyadu
wuxuu ku jiraa guriga farxadda. 5 Nin intuu nacasyada
gabaygooda maqli lahaa waxaa ka wanaagsan inuu canaanta
kuwa xigmadda leh maqlo. 6 Waayo, qosolka nacasku waa
sida qodxo dheri hoostiis ka jacjac leh, oo taasuna waa
wax aan waxba tarayn. 7 Hubaal dulmigu nin xigmad leh
wuu waalaa, oo laaluushkuna qalbiguu ka kharribaa. 8 Wax
bilowgiisa waxaa ka wanaagsan dhammaadkiisa, oo kii
dulqaadasho badanuna waa ka wanaagsan yahay kii kibir
badan. 9 Xanaaq ha ku degdegin, waayo, xanaaqu wuxuu
ku jiraa laabta nacasyada. 10 Ha odhan, Waayihii hore bal
maxay kuwan uga fiicnaayeen? Waayo, xaalkan si caqliya u
weyddiin maysid. 11 Xigmaddu sida dhaxal oo kale ayay u
wanaagsan tahay, oo waa u faa'iido kuwa qorraxda arka. 12
Waayo, xigmaddu waxay wax u daafacdaa sida lacagtu wax
u daafacdo oo kale, laakiinse aqoonta faa'iidadeedu waa in
xigmaddu ay nabadgeliso kuwa iyada haysta. 13 Bal Ilaah
shuqulkiisa ka fiirso, waayo, wixii uu isagu qalloociyey bal
yaa toosin kara? 14 Maalintii aad barwaaqaysan tahay aad u
faraxsanow, oo maalintii aad dhibaataysan tahayna aad u
fiirso in Ilaah mid u sameeyey sida kan kale si uusan ninna u
ogaan karin waxa isaga dabadiis jiri doona. 15 Waxaa jira
nin xaq ah oo xaqnimadiisa ku halligma iyo nin shar ah oo
sharnimadiisa ku cimri dheeraada; labadaba wakhtigii aan
waxtarka lahayn ee aan noolaa ayaan arkay. 16 Aad xaq ha
u noqon oo hana iska dhigin mid aad xigmad u leh, waayo,
bal maxaad isu baabbi'inaysaa? 17 Aad sharrow ha u noqon,
oo nacasna ha noqon, waayo, bal maxaad wedkaaga ka
hor u dhimanaysaa? 18 Waxaa kuu wanaagsan inaad tan
xagsatid, oo aadan gacantaadana dib uga ceshan, waayo, kii
Ilaah ka cabsada waxan oo dhan ayuu ka soo bixi doonaa.
19 Xigmaddu kan xigmadda leh way uga xoog badan tahay
toban taliye oo magaalada jooga. 20 Waayo, dhulka laguma
arag nin xaq ah oo wanaag fala, oo aan dembaabin. 21
Wax kasta oo lagu hadlo ha dhegaysan, waaba intaasoo
aad maqashaa addoonkaaga oo ku habaarayee. 22 Waayo,
marar badan ayaa qalbigaagu og yahay inaad adba saasoo
kale u habaartid kuwo kale. 23 Waxyaalahan oo dhan xigmad
baan ku tijaabiyey. Waxaan is-idhi, Xigmad baan yeelan
doonaa, laakiinse xigmaddii way iga fogayd. 24 Waayo, bal
yaa gaadhi kara wixii aad u fog ee mool dheer? 25 Waxaan
qalbigayga oo dhan u diyaariyey oo u soo jeediyey inaan
ogaado, oo baadho, oo aan doondoono xigmad iyo wax
kasta sababtiisa, iyo inaan ogaado in sharnimadu tahay
nacasnimo, iyo in doqonnimadu tahay waalli. 26 Oo waxaan
soo ogaaday wax xataa dhimashada ka sii qadhaadh,
waana naag qalbigeedu yahay dabinno iyo shabagyo, oo ay
gacmeheeduna yihiin jeebbooyin. Ku alla kii Ilaah ka farxiyo
iyaduu ka baxsan doonaa, laakiinse dembilaha way qabsan
doontaa. 27 Wacdiyuhu wuxuu leeyahay, Bal eega, si aan
sababta u garto ayaan midba mid ku daray oo waxaasaan
soo helay. 28 Oo weliba waan sii doondoonayaa, laakiinse
ma aan helo. Kun nin dhexdood ayaan nin qudha ka helay,
laakiinse kuwaas oo dhan xataa naag qudha kama helin.
29 Bal eeg, waxan keliya oo aan soo ogaaday in Ilaah
binu-aadmiga sameeyey iyagoo qumman, laakiinse waxay
doondooneen hindisooyin badan.

**8** Yaa ninka xigmadda leh la mid ah? Yaase wax micnihiisa
yaqaan? Nin xigmaddiisu wejigiisay dhalaalisaa, oo
adaygga wejigiisuna wuu beddelmaa. 2 Waxaan kugula
talinayaa inaad boqorka amarkiisa dhawrtid, dhaartii Ilaah
ee aad ku dhaaratay aawadeed. 3 Ha ku degdegin inaad

hortiisa ka tagtid, wax shar ahna ha ku sii adkaan, waayo,
isagu wuxuu sameeyaa wax alla wuxuu ku farxo. **4** Waayo,
boqorka hadalkiisu xoog buu leeyahay, oo yaase isaga
ku odhan kara, War maxaad samaynaysaa? **5** Ku alla kii
amarka dhawra innaba waxyeello ma gaadhi doonto, oo
ninka xigmadda leh qalbigiisuna wakhtiga iyo garsooriddaba
wuu gartaa. **6** Maxaa yeelay, xaal kastaaba wuxuu leeyahay
wakhti iyo garsoorid, in kastoo nin dhibaatadiisu iyadoo
weyn ay saaran tahay. **7** Maxaa yeelay, isagu garan maayo
waxa ahaan doona, waayo, bal yaa isaga u sheegi kara
siday u ahaan doonaan? **8** Ninna amar uma leh inuu nafta
ceshado, oo maalinta dhimashadana amar uma leh. Oo
wakhtiga dagaalkaasna fasax ma leh, oo sharnimaduna
ma samatabbixin doonto kuwa iyada leh. **9** Waxaas oo
dhan ayaan arkay, oo qalbigaygana waan u soo jeediyey
shuqul kasta oo qorraxda hoosteeda lagu sameeyo oo dhan.
Waxaa jira wakhti nin mid kale u taliyo oo uu wax yeelo.
**10** Oo haddana waxaan arkay sharrowyadii oo la aasay,
kuwaas oo iman jiray oo ka bixi jiray meeshii quduuska
ahayd, oo magaaladii ay waxaas ku dhex sameeyeenna
waa laga illoobay. Taasuna waa wax aan waxba tarayn.
**11** Shuqulka sharka ah xukunkiisa dhaqso looma oofiyo,
oo sidaas daraaddeed binu-aadmiga qalbigiisu inuu shar
sameeyo aad buu u damcaa. **12** In kastoo dembile boqol
jeer shar sameeyo, oo cimrigiisuna aad u sii raago, haddana
hubaal waxaan ogahay in kuwa Ilaah ka cabsada oo hortiisa
ka baqaa ay nabdoonaan doonaan. **13** Laakiinse sharrowgu
ma nabdoonaan doono, oo cimrigiisuna sii ma raagi doono
sida hooska baabba'u uusan u raagin, maxaa yeelay, isagu
Ilaah hortiisa kama cabsado. **14** Waxaa jira wax aan waxba
tarayn oo dhulka lagu sameeyo, waana inay jiraan kuwa xaqa
ah oo ay wax ku dhacaan sida shuqulka kuwa sharka ah, oo
haddana ay jiraan kuwa sharka ah oo ay wax ku dhacaan
sida shuqulka kuwa xaqa ah. Oo waxaan idhi, Taasuna
waa wax aan waxba tarayn. **15** Markaasaan farax u bogay,
maxaa yeelay binu-aadmigu inta qorraxda ka hoosaysa
kuma haysto wax uga wanaagsan inuu wax cuno, oo wax
cabbo, oo uu iska farxo, waayo, taasaa isaga raacaysa intuu
hawshoodo cimrigiisa Ilaah qorraxda hoosteeda ku siiyo. **16**
Markaan qalbigayga u soo jeedshay inaan xigmad garto, iyo
inaan arko hawsha dhulka lagu sameeyo (waayo, waxaa jira
mid aan habeen iyo maalin toona indhihiisa hurdo saarin),
**17** markaasaan shuqulka Ilaah oo dhan fiiriyey, oo gartay
inaan binu-aadmigu karin inuu soo wada ogaado shuqulka
qorraxda hoosteeda lagu sameeyo oo dhan, maxaa yeelay,
in kastoo laysku dhibo in la soo ogaado, haddana taas
innaba lama soo heli karo, oo weliba xataa haddii nin xigmad
lahu uu u maleeyo inuu soo ogaado, haddana soo ma uu
ogaan kari doono.

**9** Waxyaalahan oo dhan qalbigaygaan kaga fiirsaday si aan
u baadho in kuwa xaqa ah iyo kuwa xigmadda leh, iyo
shuqulladooduba ay gacanta Ilaah ku jiraan. Binu-aadmigu
garan maayo inay jacayl tahay iyo inay nacayb tahay toona.
Wax waluba iyagay ka horreeyaan. **2** Wax kastaaba isku
si bay dadka oo dhan ugu yimaadaan, oo isku wax baa
ku dhaca ka xaqa ah iyo ka sharka ahba, ka wanaagsan
iyo ka xunba, ka nadiifta ah iyo ka aan nadiifta ahaynba,
ka allabariga bixiya iyo ka aan allabariga bixinba. Sida
kan wanaagsanu yahay ayaa dembiluhuna yahay, oo ka
dhaartaana waa la mid kan dhaarta ka cabsada. **3** Wax xun
baa ku jira waxa qorraxda hoosteeda lagu sameeyo oo dhan,
waana in isku wax ay dadka oo dhan ku dhacaan. Oo weliba
qalbiga binu-aadmiga shar baa ka buuxa, oo qalbigoodana
intay nool yihiin waalli baa ku jirta, oo taas dabadeedna kuwii
dhintay ayay u tagaan. **4** Kii kuwa nool oo dhan la jira rajuu
leeyahay, waayo, eeygii noolu waa ka wanaagsan yahay
libaax dhintay. **5** Waayo, kuwa noolu way og yihiin inay
dhiman doonaan, laakiinse kuwa dhintay waxba ma oga, oo
innaba abaalgud dambe ma heli doonaan, waayo, iyaga waa
la illoobay. **6** Oo weliba jacaylkoodii iyo nacaybkoodii iyo
hinaasiddoodiiba way wada baabbe'een, oo innaba qayb
dambe kuma lahaan doonaan waxa qorraxda hoosteeda
lagu sameeyo oo dhan. **7** Orod oo tag, oo kibistaada
farxad ku cun, oo khamrigaagana qalbi istareexsan ku cab,
waayo, Ilaah shuqulladaadii horuu u aqbalay. **8** Had iyo
goorba dharkaagu wax cad ha ahaado, oo madaxaaguna
yuusan saliid waayin. **9** Naagtaada aad jeceshahay farxad
kula noolow intaad ku nooshahay cimrigaaga aan waxba
tarayn ee Ilaah qorraxda hoosteeda kugu siiyey oo dhan,
waayo, taasu waa qaybtaadii aad ku heshay noloshan iyo
hawshaadii aad qorraxda hoosteeda ku dhibtootay. **10** Wax
alla wixii gacantaadu hesho inay samayso xooggaaga oo
dhan ku samee, waayo, She'ool oo aad tegaysid shuqul iyo
hindiso iyo aqoon iyo xigmad toona laguma arko. **(Sheol h7585)**
**11** Markaasaan mar kale fiirsaday, oo waxaan qorraxda
hoosteeda ku arkay inaan kuwa dheereeyaa mar kasta
tartanka ku badin, ama aan kuwa xoogga badanu mar kasta
dagaalka adkaan, ama aan kuwa xigmadda lahu mar kasta
kibis helin, ama aan kuwa garaadka ahu mar kasta hodan
noqon, ama aan saanacyada mar kasta raalli laga ahayn,
laakiinse waxaa kulligood hela wakhti iyo nasiib. **12** Waayo,
ninna wedkiisa ma yaqaan. Sida kalluun shabag xun lagu
qabto, iyo sida shimbirro dabin ku dhaca, saasoo kalaa binu-

aadmigana wakhti xun lagu dabaa, markii wedku si kedis ah
ugu yimaado. 13 Oo xigmad caynkan ah ayaan qorraxda
hoosteeda ku arkay, iyana way ila weynayd. 14 Waxaa jirtay
magaalo yar oo ay dad tiro yaru dhexdeeda joogaan, oo
waxaa iyadii ku soo duulay boqor weyn. Wuu hareereeyey
oo dhufayso waaweyn hareereheeda ka dhistay. 15 Haddana
waxaa laga dhex helay nin miskiin ah oo xigmad leh, oo isna
xigmaddiisii ayuu magaaladii ku samatabbixiyey, laakiinse
haddana ninkaas miskiinka ah ciduna ma xusuusan. 16
Markaasaan idhi, Xigmaddu xoogga way ka fiican tahay, hase
ahaatee ninkii miskiin ah xigmaddiisa waa la quudhsadaa,
oo erayadiisana lama dhegaysto. 17 Kuwa xigmadda leh
erayadoodii xasilloonaan lagu maqlaa waa ka sii wanaagsan
yihiin qaylada kan nacasyada ka dhex taliya. 18 Xigmaddu
waa ka fiican tahay hubka dagaalka, laakiinse dembile qudha
ayaa wax badan oo wanaagsan baabbi'iya.

**10** Diqsiyadii dhintay saliidda cadarsameeyaha way
qudhmiyaan, oo nacasnimadii yaruna saasoo kalay kan
xigmadda loo sharfo u bi'isaa. 2 Ninkii xigmad leh qalbigiisu
xagga midigtuu u jeedaa, laakiinse nacaska qalbigiisu xagga
bidixduu u jeedaa. 3 Oo weliba kan nacaska ahu markuu
jidka marayo wuu caqli yaraadaa, oo ku alla kii uu arkaba
wuxuu u sheegaa inuu nacas yahay. 4 Haddii taliyahu kugu
dhirfo, meeshaada ha ka dhaqaaqin, waayo, qalbiqabowgu
xumaano waaweyn wuu qabowjiyaa. 5 Waxaa jira wax shar
ah oo aan qorraxda hoosteeda ku arkay, waxaana weeye
qalad taliyaha ka yimaada. 6 Nacasnimadu waxay joogtaa
meelo sarsare oo waaweyn oo taajiriintuna waxay fadhiyaan
meel hoose. 7 Waxaan arkay addoommo fardo fuushan, iyo
amiirro sida addoommo oo kale lugaynaya. 8 Kii god qodaa
isagaa ku dhici doona, oo ku alla kii deyr dumiyana abeesaa
qaniini doonta. 9 Ku alla kii dhagaxyo rujiyaaba wuu ku
dhaawacmi doonaa, oo kii qoryo jejebiyaana isagaa khatar
ku geli doona. 10 Haddii birtu af beesho, oo aan la soofayn,
waa in xoog badan lagu sii kordhiyaa, laakiinse xigmaddu
faa'iido bay leedahay si loogu liibaano. 11 Haddii abeeso wax
qaniinto iyadoo aan la falfalin, markaas ka dib falfalowgu
waxtar ma leh. 12 Kii xigmad leh erayada afkiisu waa raxmad
miidhan, laakiinse bushimaha nacasku isaga qudhiisay
baabbi'iyaan. 13 Erayada afkiisa bilowgoodu waa nacasnimo,
oo dhammaadka hadalkiisuna waa waalli baas. 14 Nacasku
hadalkiisa wuu badiyaa, waxa ahaan doona binu-aadmigu
garan maayo, oo waxa dabadiis dhici doonana bal yaa u
sheegi kara? 15 Nacasyada hawshoodu midkood kastaba
way daalisaa, maxaa yeelay, isagu xataa sida magaalada
loo tago ma yaqaan. 16 Dalkow, adaa iska hoogay, markii
boqorkaagu ilmo yar yahay, oo amiirradaaduna ay aroortii
wax cunaan! 17 Dalkow, waad barakaysan tahay, markii
boqorkaagu nin gobeed yahay, oo amiirradaaduna ay wakhti
habboon wax u cunaan inay xoog ku yeeshaan ee aan
ahayn inay sakhraamaan! 18 Caajisnimo badan saqafku
waa ku dumaa, oo shuqulla'aanta gacmahana gurigaa ku
darroora. 19 Diyaafadda waxaa loo dhigaa qosol aawadiis,
khamriguna naftuu u raaxeeyaa, oo lacagtu wax kastaba
way ka jawaabtaa. 20 Boqorka ha ku caayin xataa fikirkaaga,
oo taajirkana ha ku caayin qolladdaada jiifka, waayo, shimbir
hawada duusha ayaa codkaaga qaadi doonta, oo wax baalal
leh ayaa xaalka sheegi doona.

**11** Kibistaada biyaha korkooda ku tuur, waayo, maalmo
badan dabadood waad heli doontaa. 2 Oo toddoba
qaybood u kala qaybi iyo weliba siddeed, waayo, masiibada
dhulka iman doonta garan maysid. 3 Haddii daruuruhu roob
ka buuxsamaan, dhulkay ku soo daataan, oo haddii geed
xagga koonfureed amase xagga woqooyi u dhaco, meeshuu
u dhacay ayuu oolli doonaa. 4 Kii dabaysha eegaa waxba
ma uu beeran doono, oo kii daruuraha fiiriyaana waxba ma
goosan doono. 5 Sida aadan dabaysha jidkeeda u garanayn,
ama aadan sida lafuhu ugu dhex samaysmaan naag uur leh
maxalkeed u garanayn, saas oo kale ayaadan shuqulka
Ilaaha wax walba sameeya u garanayn. 6 Iniinahaaga
aroorta beero, oo fiidkana gacantaada ha ceshan, waayo,
innaba garan maysid mid liibaani doona, kan ama kaas,
iyo inay labadooduba isku si u wanaagsanaan doonaan
iyo in kale. 7 Sida runta ah iftiinku waa macaan yahay, oo
indhahana way u wanaagsan tahay inay qorraxda arkaan. 8
Haddii nin sannado badan noolaado, kulligood ha ku farxo,
laakiinse ha xusuusto maalmaha gudcurka, waayo, iyagu
way badnaan doonaan. Waxa imanaya oo dhammu waa
wax aan waxba tarayn. 9 Barbaarkow, barbaarnimadaada
ku farax, oo wakhtiga dhallinyaranimadaadana qalbigaagu
ha ku istareexiyo, oo sida qalbigaagu doonayo oo ay
indhahaagu arkaanba u soco, laakiinse waxaad ogaataa in
Ilaah waxyaalahaas aawadood oo dhan kuu xukumi doono.
10 Haddaba sidaa daraaddeed qalbigaaga murugta ka durki,
oo jidhkaagana xumaanta ka fogee, waayo, carruurnimada
iyo dhallinyaranimaduba waa wax aan waxba tarayn.

**12** Haddaba wakhtiga dhallinyaranimadaada Abuurahaaga
xusuuso intaan maalmaha xumu kuu iman, ama
ayan kuu soo dhowaan sannadaha aad odhan doonto,
Sannadahan kuma istareexo, 2 iyo intaan qorraxda, iyo
iftiinka, iyo dayaxa, iyo xiddiguhuba ay wada madoobaan,
ama intaan daruuruhu roobka ka daba noqon, 3 iyo inta kuwa

guriga dhawraa ay gariiraan, oo nimanka xoogga badanuna
ay soo gotaan, oo kuwa wax shiidaana ay tiradooda yar
aawadeed shuqulka u joojiyaan, oo kuwa daaqadaha wax ka
fiiriyaana ay madoobaadaan,
4 iyo inta albaabbada jidadka
lagu xidho, iyo inta sanqadha shiididdu ay gaaban tahay, oo
shimbirta cideeda lagu tooso, oo gabdhaha muusikaduna
ay wada taag darnaadaan.
5 Waxa sarreeya ayay ka
baqi doonaan, oo jidadka dhexdoodana waxyaalo cabsi
ah ayaa jiri doona, oo geedka yicibtu waa ubxin doonaa,
oo koronkorraduna way isculaysin doonaan, oo damacuna
wuu baabbi'i doonaa, maxaa yeelay, binu-aadmigu wuxuu
tagaa hoygiisa daa'imka ah, oo kuwa baroortaana jidadkay
warwareegaan.
6 Abuurahaaga xusuuso intaan xadhigga
lacagta ahu kala go'in, ama aan maddiibadda dahabka
ahu kala jabin, ama aan jalxaddu isha biyeed agteeda ku
burburin, ama aan giraangirta ceelku jabin,
7 iyo intaan
ciiddu dhulka ku noqon siday horeba ahayd, oo ruuxuna ku
noqon Ilaahii horeba siiyey.
8 Wacdiyuhu wuxuu leeyahay,
Waa wax aan waxba tarayn, wax waluba waa wax aan
waxba tarayn.
9 Oo haddana wacdiyuhu xigmad buu lahaa,
oo weliba dadkuu aqoon baray. Wuxuu aad uga fikiray,
oo baadhay, oo isku hagaajiyey maahmaahyo badan.
10
Wacdiyuhu wuxuu doonay inuu soo helo erayo la aqbalo
iyo wixii si qumman loo qoray oo ahaa hadal run ah.
11
Erayada kuwa xigmadda lahu waa sida wax wax muda
oo kale, oo maahmaahyada la soo urursha yna waa sida
musmaarro la adkeeyey; adhijir qudha ayaa bixiyey.
12
Oo weliba, wiilkaygiiyow, waxyaalahan ku waano qaado.
Buugag badan samayntoodu innaba dhammaad ma leh,
oo waxbarashada badanuna jidhkay daalisaa.
13 Xaalkan
soo koobiddiisii waa tan. Waa la wada maqlay. Ilaah ka
cabso, oo amarradiisana dhawr, waayo, taasu waa waxa
binu-aadmiga oo dhan u gudboon.
14 Waayo, Ilaah wuu
xukumi doonaa shuqul kasta, iyo wax kasta oo qarsoon, ha
fiicnaadeen ama ha xumaadeene.

# Gabaygii Sulaymaan

1 Kanu waa gabaygii gabayada ee Sulaymaan. 2
Isagu ha igu dhunkado dhunkashooyinka afkiisa;
Waayo, jacaylkaagu xataa khamri wuu ka sii macaan
yahay. 3 Saliiddaadu caraf wanaagsan bay leedahay, Oo
magacaaguna waa sida saliidcadar la shubay, Oo sidaas
daraaddeed baa habluhu kuu jecel yihiin. 4 I soo jiido,
waannu kaa daba ordaynaaye. Boqorkii wuxuu i soo geliyey
qolladihiisii. Saaxiibadaha Hadlayaa Annagu waannu kugu
farxi doonnaa, oo waannu kugu rayrayn doonnaa, Oo
jacaylkaagana waxaannu u sii xusuusan doonnaa in khamri
ka sii badan. Gacalisada Hadlaysaa Si qumman ayay
kuu jecel yihiin. 5 Gabdhaha reer Yeruusaalemow, Anigu
waan madoobahay, laakiinse waan u qurxoonahay Sida
teendhooyinkii reer Qedaar Iyo sida daahyadii Sulaymaan. 6
Ha ii soo dhuganina madowgayga qorraxdu i gubtay aawadiis.
Wiilashii hooyaday ayaa ii cadhooday, Oo waxay iga dhigeen
ilaaliyihii beeraha canabka ah, Laakiinse beertayda canabka
ah ma aan dhawrayn. 7 Kan naftaydu jeceshahayow, ii
sheeg Meesha aad adhigaaga daajisid, iyo meesha aad
hadhkii hadhisid; Waayo, bal maxaan u ahaanayaa Sida mid
ag wareegta adhyaha saaxiibbadaa? 8 Taada naagaha ugu
qurux badanay, haddaadan aqoon, Waxaad daba gashaa
adhiga raadkiisa, Oo waxaad waxarahaaga ag daajisaa
teendhooyinka adhijirrada. 9 Taan jeclahayay, waxaan
kugu masaalay Faras ka mid ah fardihii gaadhifardoodyadii
Fircoon. 10 Dhabannadaadu waxay la qurxoon yihiin timo
tidcan, Oo qoortaaduna laasimmo jowharad ah. 11 Waxaannu
kuu samaynaynaa silsilado dahab ah Oo lacag laga taagay. 12
Inta boqorku miiskiisii fadhiyey, Ayaa cadarkaygii naaradiinka
ahaa caraftiisu soo baxday. 13 Gacaliyahaygu wuxuu ii yahay
sida guntin malmal ah Oo habeenkii oo dhan naasahayga ku
dhex jirta. 14 Gacaliyahaygu wuxuu ii yahay sida xidhmo
ubax xinne ah Oo beeraha canabka ah ee Ceyn Gedii ku
yaal. 15 Taan jeclahayay, bal eeg, adigu waad qurxoon
tahay, bal eeg, waad qurxoon tahay, Oo waxaad leedahay
indhaha qoolleyda oo kale. 16 Gacaliyahaygow, bal eeg,
adba waad qurxoon tahay, waanad wacan tahay, Oo weliba
sariirteennuna waa cagaar. 17 Alwaaxda gurigeennu waa
qoryo kedar ah, Oo saqafkeennuna waa qoryo beroosh ah.

2 Anigu waxaan ahay ubaxnarjiska Shaaroon, Iyo
ubaxshooshanka dooxooyinka. 2 Sida ubaxshooshanku
qodxanta ku dhex yahay, Ayay taan jeclahayna gabdhaha ku
dhex tahay. 3 Sida geedka tufaaxa ahu uu dhirta duurka
ku dhex yahay, Ayuu gacaliyahayguna wiilasha ku dhex
yahay. Hooskiisaan fadhiistay anigoo aad u faraxsan, Oo
midhihiisuna way ila dhadhan macaanaayeen. 4 Wuxuu i
keenay guriga diyaafadda, Oo calankiisii i kor sudhnaana
wuxuu ahaa jacayl. 5 Sabiib igu quudi, oo tufaax igu
noolee, Waayo, anigu caashaq baan la bukaa. 6 Gacantiisa
bidix madaxaygay ka hoosaysaa, Oo gacantiisa midigna
way igu duuban tahay. 7 Gabdhaha reer Yeruusaalemow,
waxaan idinku dhaarinayaa Cawsha iyo deerada duurka
Inaydaan jacayl kicin, ama aydaan toosin Ilaa uu doono. 8
Waa kaa codkii gacaliyahaygu! Bal eega, wuu soo socdaa,
Isagoo buuraha korkooda ku soo boodboodaya, oo kuraha
dushooda ku faclaynaya. 9 Gacaliyahaygu waa sida cawl
ama deer qayrab ah oo kale. Bal eega, wuxuu taagan yahay
derbigayaga gadaashiisa, Oo daaqadahuu ka soo eegayaa,
oo shabagguu ka soo dayayaa. 10 Markaasaa gacaliyahaygii
ila hadlay oo wuxuu igu yidhi, Taan jeclahayay, soo kac,
taydan qurxoonay i soo raac. 11 Waayo, qabowgii wuu na
dhaafay, Oo roobkiina wuu dhammaaday, wuuna qaaday, 12
Ubaxii dhulkuu ka muuqanayaa, Oo wakhtigii shimbirruhu
gabyi jireenna waa la gaadhay, Oo codkii qoolleydana
dalkayagaa laga maqlayaa. 13 Berduhu midhihiisuu soo
bixinayaa, Oo geedaha canabkuna way ubxinayaan, Wayna
soo carfayaan. Taan jeclahayay, soo kac, taydan qurxoonay
i soo raac. 14 Qoolleydayda qararka dillaacyadooda iyo
meelahooda qarsoon ee dalcad ah ku jirta, Bal jaahaaga
i tus, oo codkaaga i maqashii, Waayo, codkaagu wuu
macaan yahay, oo jaahaaguna wuu surad wacan yahay. 15
Dawacooyinka noo qabta, kuwaasoo ah dawacooyinka yaryar
ee beerahayaga canabka ah bi'iya, Waayo, beerahayaga
canabka ahu haatan way ubxinayaan. 16 Gacaliyahaygu waa
kaygii oo anna tiisii baan ahay. Wuxuu adhigiisa daajinayaa
ubaxyada dhexdooda. 17 Ilaa waagu baryo, oo hoosku
baabba'o, Gacaliyahaygiiyow, soo noqo, oo ahow sida cawl
oo kale, amase sida deer qayrab ah Oo buuraha Beter kor
jooga.

3 Goor habeennimo ah ayaan sariirtayda ka doondoonay
kan naftaydu jeceshahay. Waan doondoonay, laakiinse
ma aanan helin. 2 Haddaba waan kacayaa, oo magaaladaan
dhex wareegayaa, Oo dariiqyada iyo jidadka waaweyn
Ayaan ka dhex goobayaa kan naftaydu jeceshahay. Waan
doondoonay laakiinse ma aanan helin. 3 Waxaa i helay
waardiyayaashii magaalada dhex warwareegayay, Oo anna
waxaan ku idhi, Kan naftaydu jeceshahay ma aragteen? 4
Oo kolkaan iyagii in yar sii dhaafay Ayaan helay kii naftaydu
jeceshahay. Waan qabtay, mana sii dayn, Ilaa aan isaga
gurigii hooyaday keenay, Oo aan qolladdii tii i uuraysatay

geliyey. 5 Gabdhaha reer Yeruusaalemow, waxaan idinku
dhaarinayaa Cawsha iyo deerada duurka Inaydaan jacayl
kicin ama aydaan toosin Ilaa uu doono. 6 Waa kuma kan
cidlada uga soo baxaya sida tiirar qiiq ah? Oo ay malmalka,
iyo fooxa, Iyo dhirta udgoon ee baayacmushtariga oo
dhammu ka carfayaan? 7 Bal eeg, waa sariirta Sulaymaan
lagu qaadee. Lixdan nin oo xoog badan oo ka mid ah kuwa
xoogga badan ee reer binu Israa'iil Ayaa hareereheeda ku
wareegsan. 8 Kulligood seefta aad bay u yaqaaniin, waana
wada dagaalyahan. Ninkood kastaba seeftiisii dhexday
ugu xidhan tahay, Cabsida habeenka aawadeed. 9 Boqor
Sulaymaan wuxuu kursi la qaado Ka samaystay qoryihii
Lubnaan. 10 Tiirarkiisii lacag buu ka dhigay, Hoostiisiina
dahab buu ka dhigay, oo meeshuu fadhiistayna guduud buu
ka dhigay, Oo dhexdiisiina gabdhaha reer Yeruusaalem ayaa
jacayl ku sharraxay. 11 Gabdhaha reer Siyoonow, bal baxa,
oo Boqor Sulaymaan eega, Isagoo qaba taajkii hooyadiis
madaxa u saartay maalintii arooskiisa, Iyo maalintii qalbigiisu
faraxsanaa.

**4** Taan jeclahayay, bal eeg, adigu waad qurxoon tahay,
bal eeg, waad qurxoon tahay, Oo waxaad leedahay
indhaha qoolleyda oo kale oo indhashareertaada ku qarsoon.
Timahaaguna waa sida riyo Buur Gilecaad ka muuqda.
2 Ilkahaaguna waa sida laxo loo xiiray, Oo ka soo baxay
meeshii lagu soo maydhay, Oo middood kastaaba mataano
dhashay, Oo aan dhexdooda lagu arag mid dhicisay. 3
Bushimahaagu waa sida dun guduudan, Oo afkaaguna
waa qurxoon yahay, Oo dhafoorradaada indhashareertaada
ku qarsoonuna waa sida xabbad rummaan ah jeexeed.
4 Qoortaaduna waa sida munaaraddii Daa'uud oo loo
dhisay inay ahaato meel hubka dagaalka la dhigto, Oo
ay sudhan yihiin kun gaashaan, Oo ah gaashaammadii
ragga xoogga badan oo dhan. 5 Oo labadaada naasna
waa sida laba gibin oo mataano ah oo cawl dhashay. Oo
ubaxshooshannada dhexdooda daaqaya. 6 Ilaa waagu
baryo, oo hoosku baabbo'o, Waxaan u kici doonaa buurta
malmalka, Iyo kurta fooxa. 7 Taan jeclahayay, adigu waad
qurxoon tahay, Oo innaba iin ma lihid. 8 Aroosaddaydiiyey,
Buur Lubnaan iga soo raac, Oo kaalay, Buur Lubnaan iga
soo raac. Buur Amaanaah dhaladeeda wax ka fiiri, Oo Buur
Seniir iyo Buur Xermoon dhaladooda wax ka fiiri, Oo wax ka
soo fiiri boholaha libaaxyada, Iyo buuraha shabeelladaba.
9 Walaashayay, aroosaddaydiiyey, qalbigaygii waad la
tagtay, Oo waxaad qalbigayga kula tagtay daymooyinka
indhahaaga middood Iyo laasimmada qoortaada midkood. 10
Walaashayay, aroosaddaydiiyey, jacaylkaagu qurux badanaa!
Oo jacaylkaagu intee buu khamri ka sii fiican yahay! Oo
saliiddaada carafteeduna way ka fiican tahay dhirta udgoon
oo dhan. 11 Aroosaddaydiiyey, bushimahaaga malab baa
ka soo tiftifqaya, Oo carrabkaaga hoostiisana malab iyo
caanaa ku jira. Oo dharkaaga caraftiisuna waa sida carafta
Buur Lubnaan. 12 Walaashayay, aroosaddaydiiyey, waxaad
tahay sida beer la xidhay, Iyo ilbiyood la awday, iyo durdur la
xidhay. 13 Dhirtaadu waa beer ay ku dhex yaalliin rummaan,
iyo dhir kale oo midho aad u wanaagsan, Iyo xinne iyo
naaradiin, 14 Naaradiin iyo huruud, Iyo kalamus iyo qorfe,
iyo dhir kasta oo foox dhasha, Iyo malmal iyo cuud iyo dhir
udgoon oo fiican oo dhan. 15 Waxaad tahay ilbiyood beero
waraabisa, Iyo ceel biyo nool leh, Iyo durdurro Buur Lubnaan
ka soo qulqulaya. 16 Dabaysha woqooyay, soo kac, oo tan
koonfureeday, kaalay, Oo beertayda necaw ku afuufa si ay
dhirteeda udgoonu uga soo carfaan, Gacaliyahaygu beertiisa
ha soo galo oo midhaheeda wacan ha cuno.

**5** Walaashayay, aroosaddaydiiyey, beertaydii waan soo
dhex galay. Malmalkaygiina dhirtaydii udgoonayd baan
la gurtay, Oo awlalladaydii shinniyeed iyo malabkaygiina
waan cunay, Khamrigaygii iyo caanahaygiina waan cabbay,
Saaxiibadaha Hadlayaa Saaxiibbadayow, wax cuna, Wax
cabba, gacaliyayaalow, aad u cabba. 2 Anigu waan
hurday, laakiinse qalbigaygu waa soo jeeday. Waxaan
maqlay codkii gacaliyahayga oo albaabka garaacaya,
isagoo leh, Walaashayay, taan jeclahayay, qoolleydaydiiyey,
tayda sanay, iridda iga fur, Waayo, madaxayga waxaa ka
buuxa dharab, Oo timahaygana waxaa qoyay dhibicyihii
habeennimada. 3 Dharkaygii waan iska bixiyey, bal sidee
baan u xidhaa? Oo cagahaygiina waan maydhay, bal
sidee baan u wasakheeyaa? 4 Gacaliyahaygii wuxuu
gacantiisii ka soo dusiyey daloolkii albaabka, Oo qalbigaygu
isaguu u dhaqaaqay. 5 Waxaan u sara joogsaday inaan
gacaliyahayga iridda ka furo, Oo gacmahaygana waxaa
ka daadanayay malmal, Farahaygana malmalku Wuxuu
kaga tiftifqay qataarkii albaabka. 6 Gacaliyahaygii waan ka
furay, Laakiinse gacaliyahaygii wuu iska noqday, wuuna
tegey. Naftaydii markuu hadlay way naxday. Isagaan
doondoonay, laakiinse waan heli kari waayay. Waan u
dhawaaqay, laakiinse innaba iima uu jawaabin. 7 Oo
waardiyayaashii magaalada dhex warwareegayay ayaa
i helay Wayna i garaaceen oo i dhaawaceen. Oo kuwii
derbiyada dhawrayay ayaa garbasaartaydii iga qaaday. 8
Gabdhaha reer Yeruusaalemow, Waxaan idinku dhaarinayaa,
haddaad gacaliyahaygii aragtaan, U sheega inaan caashaq
la buko. 9 Gacaliyahaagu muxuu gacaliye kale dheer

yahay, Taada naagaha ugu qurxoonay? Bal gacaliyahaagu
muxuu gacaliye kale dheer yahay, Waadigaa sidan noo
dhaarinayee? **10** Gacaliyahaygu waa cad yahay oo waa
casaan. Waana kan toban kun ugu wanaagsan. **11** Madaxiisu
waa sida dahab saafi ah, Oo timihiisuna waa sida cawbaar,
oo waxay u madow yihiin sida tuke oo kale. **12** Indhihiisu waa
sida indho qoolley oo durdur biya ah ag joogta, Oo caano
lagu maydhay oo si qumman loo dhigay. **13** Dhabannadiisu
waa sida beer dhir udgoon ah iyo sida ubaxyo carfa. Oo
bushimihiisuna waa sida ubaxshooshanno uu malmal ka
tiftifqayo. **14** Gacmihiisu waa sida kaatummo dahab ah oo
berullos lagu dhejiyey, Oo jidhkiisuna waa sida foolmaroodi
oo dhalaalaya oo safayr lagu sharraxay. **15** Lugihiisu waa
sida tiirar marmar ah, oo lagu qotomiyey saldhigyo dahab
saafiya ah, Oo muuqashadiisuna waa sida Buur Lubnaan
oo kale, oo wuxuu u qurxoon yahay sida geedaha kedarka
oo kale. **16** Afkiisu aad iyo aad buu u macaan yahay, oo
isaga dhammaantiis waa mid aad loo jecel yahay. Gabdhaha
reer Yeruusaalemow, Kaasu waa gacaliyahayga, waana
saaxiibkayga.

**6** Taada naagaha u qurxoonay, Xaggee gacaliyahaagii
tegey? Aannu kula goobnee, Xaggee buu gacaliyahaagii u
leexday? **2** Gacaliyahaygii wuxuu u dhaadhacay beertiisa, iyo
beer qaybaheed oo dhir udgoon ah Inuu adhigiisa soo daajiyo
beeraha dhexdooda, oo uu soo ururisado ubaxshooshanno.
**3** Anigu waxaan ahay tii gacaliyahayga, oo gacaliyahayguna
waa kaygii, Oo wuxuu adhigiisa daajiyaa ubaxshooshannada
dhexdooda. **4** Taan jeclahayay, waxaad u qurux badan tahay
sida Tirsaah oo kale, Oo waxaad u suurad wacan tahay
sida Yeruusaalem oo kale, Waxaana lagaaga cabsadaa sida
ciidan calammo sita oo kale. **5** Indhahaaga iga sii jeedi,
Waayo, way iga adkaadeen. Timahaagu waa sida riyo Buur
Gilecaad ka muuqda. **6** Ilkahaaguna waa sida laxo Ka soo
baxay meeshii lagu soo maydhay, Oo middood kastaaba
mataano dhashay, Oo aan dhexdooda lagu arag mid dhicisay.
**7** Oo dhafoorradaada indhashareertaada ku qarsoonuna
waa sida xabbad rummaan ah jeexeed. **8** Waxaa jira lixdan
boqoradood, iyo siddeetan naagood oo addoommo ah, Iyo
gabdho aan tiro lahayn. **9** Laakiinse qoolleydayda, iyo tayda
sanu waa mid qudha. Iyadu waa tan keliya ee hooyadeed,
Oo waa tan daahirsan ee tii iyada dhashay. Gabdhuhu
iyaday arkeen oo waxay ku sheegeen mid barakaysan, Oo
xataa boqoradihii iyo naagihii addoommaha ahaaba way
ammaaneen. **10** Waa tuma tan u soo muuqata sida kaaha
waaberiga, Oo sida dayaxa u qurxoon, Ee sida qorraxda u
daahirsan, Oo haddana looga cabsado sida ciidan calammo
sita oo kale? **11** Waxaan ku dhaadhacay beertii yicibta Inaan
soo arko geedaha cagaarka ah ee dooxada, Iyo inaan soo
arko bal in canabkii magoolay, Oo uu rummaankii ubxiyey
iyo in kale. **12** Anigoo aan garanayn ayaa nafsaddaydu
iga dhigtay sida gaadhifardoodkii Cammiinaadiib oo kale.
**13** Tan reer Shuuleemay, soo noqo, soo noqo, Aan ku
daawannee soo noqo, soo noqo. Gacaliyaha Hadlayaa Bal
maxaad u daawanaysaan tan reer Shuuleem Sida cayaarta
Maxanayim?

**7** Gabadha amiirku dhalayay, cagahaagu qurux badanaa
markay kabo illan yihiin, Bowdooyinkaagu waa sida dahab
Nin saanac ahu gacantiisa ku sameeyey. **2** Xudduntaadu waa
sida fijaan goobaaban Oo aan innaba khamri ka dhinnanayn,
Oo xaluskaaguna waa sida sarreen meel tuunsan Oo
ubaxshooshanno lagu wareejiyey. **3** Labadaada naasna
waa sida laba gibin Oo mataano ah oo cawl dhashay.
**4** Qoortaaduna waa sida munaarad foolmaroodi ah, Oo
indhahaaguna waa sida ballidii Xeshboon oo ku ag yaal iridda
Batrabbiim. Oo sankaaguna waa sida munaaradda Lubnaan
Oo xagga Dimishaq u jeeda. **5** Madaxaagu sida Buur Karmel
oo kale wuu dheer yahay, Oo timaha madaxaaguna waa
sida guduud oo kale, Oo boqorkuna wuu ku xidhan yahay. **6**
Taan jeclahayay, qurux badnidaa! Fiicnaan badnidaa! Aad
baad iiga farxisaa! **7** Sarajooggaagu waa sida geed baar ah,
Oo naasahaaguna waa sida rucubyo canab ah. **8** Waxaan
is-idhi, Geedka baarka waan fuuli doonaa, Oo waxaan
qabsan doonaa laamihiisa. Naasahaagu ha ahaadeen sida
rucubyo canab ah, Oo sankaaga neeftiisuna ha u carafto sida
midho tufaax ah. **9** Oo afkaaguna ha ahaado sida khamri
wanaagsan. Gacalisada Hadlaysaa Si qumman oo macaan
ha ugu socda gacaliyahayga, Oo kuwa hurda bushimahooda
ka hadliya. **10** Anigu waxaan ahay tii gacaliyahayga, Oo
damaciisuna xaggayguu soo jiraa. **11** Gacaliyahaygow,
kaalay, aynu duurka isla tagnee, Oo aynu tuulooyinka ku soo
dhaxnee. **12** Aynu aroor hore beercanabyada tagnee, Oo
aynu soo aragno bal in canabkii magoolay, oo ay ubixiisii
soo muuqdeen, Oo uu rummaankii ubxiyey iyo in kale;
Oo halkaasaan jacaylkayga kugu siin doonaa. **13** Ubixii
duudaygu way soo carfayaan, Oo albaabbadayada agtooda
waxaa yaal midho cayn kasta ah oo cusayb iyo duugba leh,
Oo adigaan kuu kaydiyey, gacaliyahaygiiyow.

**8** Haddaad ahaan lahayd walaalkay Oo naasihii hooyaday
nuugay, Markaan dibadda kaa helaba waan ku dhunkan
lahaa. Oo innaba layma quudhsadeen. **2** Waan ku soo
kaxayn lahaa oo waxaan ku gelin lahaa guriga hooyaday,
Wax baadna i bari lahayd. Oo waxaan ku cabsiin lahaa

khamriga xawaashka leh Ee biyaha rummaankayga laga
sameeyey. 3 Gacantiisa bidix madaxaygay ka hoosayn
lahayd, Oo gacantiisa midigna way isku kay duubi lahayd. 4
Gabdhaha reer Yeruusaalemow, waxaan idinku dhaarinayaa
Inaydaan jacayl kicin, ama aydaan toosin, Ilaa uu doono. 5
Waa tuma tan cidlada ka soo baxaysa, Ee gacaliyeheeda ku
tiirsanu? Gacalisada Hadlaysaa Waxaan kaa soo kiciyey
geed tufaax ah hoostiis. Halkaasaa hooyadaa kugu foolatay,
Oo halkaasay tii ku dhashay kugu foolatay. 6 Qalbigaaga
korkiisa ii dhig sida shaabad oo kale, oo gacantaada korkeeda
ii dhig sida shaabad oo kale, Waayo, jacaylku wuxuu u
xoog badan yahay sida geeri oo kale, Oo masayrkuna
wuxuu u nac weyn yahay sidii She'ool oo kale. Belbelkiisu
waa sida belbel dab ah, Oo waa ololka ugu wada kulul
ee Rabbiga. **(Sheol h7585)** 7 Biyo badanu jacayl ma demin
karaan, Oo daadadkuna innaba ma qarqin karaan. Haddii
nin damco inuu jacayl soo siisto maalka gurigiisa oo dhan,
Haddana dhammaan waa la quudhsan lahaa. 8 Annagu
waxaannu leennahay walaal yar, Oo aan innaba naaso
lahayn. Haddaba bal maxaannu walaashayo u samayn
doonnaa Maalintii iyada guur loo soo doonto? 9 Hadday derbi
tahay waxaannu korkeeda ka dhisi doonnaa munaarad lacag
ah, Oo hadday albaab tahayna waxaannu iyada ku hareerayn
doonnaa alwaaxyo kedar ah. 10 Anigu waxaan ahay derbi,
oo naasahayguna waa sida munaaradaha oo kale. Oo
markaas waxaan hortiisa ku ahaa sidii mid nabad heshay. 11
Sulaymaan beercanab buu Bacal Hamoon ku lahaa; Oo
beercanabkii wuxuu ka kireeyey kuwa dhawra, Oo midkood
kastaaba wuxuu midhaheeda uga keeni jiray kun xabbadood
oo lacag ah. 12 Beercanabkayga ah kan aan iska leeyahay,
hortayduu ku yaal, Haddaba Sulaymaanow, adigu waxaad
heli doontaa kun, Kuwa midhihiisa dhawraana laba boqol.
13 Taada beeraha dhexdooda degganay, Rafiiqyadaadu
waxay dhegaystaan codkaaga, Haddaba, bal i maqashii. 14
Gacaliyahaygow, dhaqso, Oo waxaad ahaataa sida cawl
ama deer qayrab ah Oo buuraha dhirta udgoon kor jooga.

# Ishacyaah

**1** Kanu waa wixii Ishacyaah ina Aamoos la tusay ee uu ku
arkay wax ku saabsan dalka Yahuudah iyo Yeruusaalem
waagii ay Cusiyaah, iyo Yootam, iyo Aaxaas, iyo Xisqiyaah
boqorrada ka ahaayeen dalka Yahuudah. **2** Samooyinkow
maqla, dhulkow bal wax dhegayso, waayo, Rabbigu wuu
hadlay oo yidhi: Carruur baan quudiyey oo koriyey, oo iyana
way igu caasiyoobeen. **3** Dibigu kan isaga leh wuu yaqaan,
oo dameerkuna waa yaqaan meeshuu wax ka cuno ee
sayidkiisa, laakiinse reer binu Israa'iil waxba ma yaqaaniin,
oo dadkayguna waxba garan maayaan. **4** Hoog waxaa
leh quruuntan dembiga badan, iyo dadkan xumaanta ku
raran, iyo dhashan xumaanfalayaasha, iyo wiilashan si xun u
macaamilooda. Iyagu Rabbiga way ka tageen, oo waxay
quudhsadeen Ka Quduuska ah ee reer binu Israa'iil dib
bayna uga noqdeen. **5** Bal maxaa mar dambe wax laydiinku
dhufan doonaa, oo aad u sii fallaagoobi doontaan? Madaxa
oo dhammu waa bukaa, oo qalbiga oo dhammuna waa taag
daranyahay. **6** Madaxa iyo minjaha inta ka dhex leh innaba
caafimaad ma leh, laakiinse waxaa ku yaal nabro, iyo burbur,
iyo boogo cusub, lama awdin, lamana duubin, oo saliidna
laguma dhayin. **7** Dalkiinnii waa cidla, magaalooyinkiinniina
waa la gubay, oo waddankiinniina shisheeyayaal baa
hortiinna ku cunay, waana cidla, sidii wax ay shisheeyayaal
afgembiyeen. **8** Oo magaalada Siyoonna waxaa looga tegey
sidii waab beercanab ku dhex yaal, iyo sidii buul beer khijaar
ah ku dhex yaal, iyo sidii magaalo cadow hareereeyey. **9**
Haddaan Rabbiga ciidammadu dad aad u yar inoo reebin,
sida Sodom baan noqon lahayn, oo sida Gomorana baan
noqon lahayn. **10** Taliyayaasha Sodomow, Rabbiga eraygiisa
maqla, dadka Gomorow, sharciga Ilaahayaga dhegta u
dhiga. **11** Rabbigu wuxuu leeyahay, Allabaryadiinna tirada
badanu bal maxay ii yihiin? Waan ka dhergay qurbaanno
guban oo wanan ah iyo xoolo buurbuuran baruurtood, kuma
farxo dhiigga dibida, iyo ka baraarka iyo ka orgida toona.
**12** Markaad u timaadaan inaad i hor istaagtaan, bal yaa
weyddiista inaad barxadahayga ku joogjoogsataan? **13**
Mar dambe ha ii keenina qurbaanno aan waxtar lahayn,
fooxu waa ii karaahiyo, bilaha cusub, iyo maalmaha sabtida,
iyo isuyeedhidda shirarkaba uma aan adkaysan karo, oo
xataa shirka weyn waa dembi. **14** Bilihiinna cusub iyo
ciidihiinnaba naftaydu way neceb tahay, waa ii culays, inaan
u adkaysto waan ka daalay. **15** Oo markaad gacmihiinna
ii soo hoorsataanna indhahayga waan idinka qarinayaa,
oo markaad tukasho ku noqnoqataanna idin maqli maayo,
waayo, gacmihiinnu waa dhiig miidhan. **16** Maydha, oo
isnadiifiya, oo falimihiinna sharkooda, indhahayga hortooda
ka fogeeya, oo sharka aad samaysaan daaya. **17** Inaad wax
wanaagsan samaysaan barta, oo caddaalad doondoona,
oo kuwa la dulmay u gargaara, agoonta gartooda u qaada,
oo carmallada u muddaca. **18** Rabbigu wuxuu leeyahay,
Haatan kaalaya oo aynu u wada fiirsannee. In kastoo ay
dembiyadiinnu guduudan yihiin, sida baraf cad oo kalay u
caddaan doonaan, oo in kastoo ay cascas yihiin, sida suuf oo
kalay ahaan doonaan. **19** Haddaad raalli tihiin oo aad dhega
nugushihiin, waxaad cuni doontaan dalka barwaaqadiisa, **20**
haddiise aad diiddaan oo aad caasiyowdaan, waxaa idin
wada baabbi'in doonta seef, waayo, afkii Rabbiga ayaa saas
ku hadlay. **21** Magaaladii aaminka ahayd oo caddaaladdu
ka buuxday, sidee bay dhillo u noqotay! Waxaa ku jiri jirtay
xaqnimo, haatanse waxaa jooga gacankudhiiglayaal! **22**
Lacagtaadii wasakh bay noqotay, khamrigaagiina waxaa ku
qasmay biyo. **23** Amiirradaadii way caasiyoobeen, oo waxay
u wehel yeeleen tuugag, oo mid walubana wuxuu jecel
yahay laaluush, oo wuxuu daba ordaa abaalgudyo. Agoonta
gartooda uma qaadaan, oo dacwada carmalkuna hortooda
ma timaado. **24** Haddaba sidaas daraaddeed Sayidka ah
Rabbiga ciidammada, oo ah Ka xoogga badan ee reer
binu Israa'iil wuxuu leeyahay, Way, anigu nacabyadayda
waan ka nasan doonaa, oo cadaawayaashaydana waan ka
aar gudan doonaa. **25** Oo haddana gacantayda waan ku
saari doonaa, oo wasakhdaadana aad baan kaaga nadiifin
doonaa, waxaaga aan saafi ahayn oo dhanna waan kaa bixin
doonaa. **26** Oo waxaan kuu soo celin doonaa xaakinnadaadii
sidii markii hore oo kale, oo lataliyayaashaadana waxaan
ka dhigi doonaa sidii bilowgii oo kale, oo dabadeedna
waxaa laguugu yeedhi doonaa Magaalada xaqnimada, iyo
magaalada aaminka ah. **27** Siyoon waxaa lagu soo furan
doonaa caddaalad, oo kuweeda soo noqdayna waxaa lagu
soo furan doonaa xaqnimo. **28** Laakiinse kuwa xadgudba
iyo dembilayaasha isku mar baa la burburin doonaa, oo
kuwa Rabbiga ka tagana waa la wada baabbi'in doonaa. **29**
Waayo, way ku ceeboobi doonaan geedihii aad jeclaateen,
oo beerihii aad doorateenna waad ku qasmi doontaan. **30**
Waayo, idinku waxaad ahaan doontaan sida geed caleentiisu
dhado iyo sida beer aan biyo lahayn. **31** Kan xoogga badanu
wuxuu noqon doonaa sida shootali oo kale, oo shuqulkiisuna
wuxuu noqon doonaa sida dhimbiil oo kale, oo labadooduba
way isla guban doonaan, oo lama demin doono iyaga.

**2** Kanu waa eraygii uu Ishacyaah ina Aamoos ku arkay
wax ku saabsan dalka Yahuudah iyo Yeruusaalem. **2**
Ugu dambaysta buurta guriga Rabbigu waxay ka taagnaan

doontaa buuraha korkooda, oo kurahana way ka wada
sara mari doontaa, oo quruumaha oo dhammuna iyaday ku
qulquli doonaan. 3 Oo dad badan baa halkaas tegi doona oo
waxay odhan doonaan, Ina keena, buurta Rabbiga aynu u
kacnee, oo guriga Ilaaha reer Yacquub aynu tagnee, oo isna
wuxuu ina bari doonaa jidadkiisa, oo innana waxaynu mari
doonnaa waddooyinkiisa, waayo, sharcigu wuxuu ka soo
bixi doonaa Siyoon, erayga Rabbiguna Yeruusaalem. 4 Oo
isaguna quruumuhuu u kala garsoori doonaa, oo dad badan
ayuu canaanan doonaa, oo iyana waxay seefahooda ka
tuman doonaan marashiyo, warmahoodana manjooyin, oo
quruunina quruun kale seef uma qaadan doonto, oo innaba
mar dambe dagaal ma ay baran doonaan. 5 Reer Yacquubow,
kaalaya, oo aynu iftiinka Rabbiga ku dhex soconnee. 6 Waad
ka tagtay dadkaagii reer Yacquub, maxaa yeelay, waxay ka
buuxsameen waxyaalihii bariga, oo waa faaliyayaal sida reer
Falastiin, oo waxay la heshiiyaan dad shisheeyayaal ah. 7
Oo weliba dalkooda waxaa ka buuxa lacag iyo dahab, oo
khasnadahooduna dhammaad ma leh, oo weliba dalkooda
waxaa ka buuxa fardo, oo gaadhifardoodyadooduna innaba
dhammaad ma leh. 8 Oo weliba dalkooda waxaa ka buuxa
sanamyo, oo waxay caabudaan shuqulkii gacmahooda,
iyo wixii ay farahoodu sameeyeen. 9 Oo ninka hoose waa
u foororsadaa, oo ninka weynuna waa isu hoosaysiiyaa,
haddaba dembigooda ha ka cafiyin. 10 Cabsida Rabbiga,
iyo sharafta haybaddiisa dhagaxa ka gal, oo ciidda kaga
dhuumo. 11 Binu-aadmiga indhihiisa kibray waa la hoosaysiin
doonaa, oo dadka madaxweynaantiisana hoos baa loo
soo dejin doonaa, oo Rabbiga keliya ayaa maalintaas la
sarraysiin doonaa. 12 Waayo, Rabbiga ciidammadu wuxuu
maalin u haystaa ku kasta oo kibra oo madax weynaada, iyo
ku kasta oo kor isu qaada, waana la hoosaysiin doonaa,
13 iyo weliba geedaha kedar la yidhaahdo ee Lubnaan
ee dhaadheer ee sare u baxa oo dhan, iyo geedaha
eelaah la yidhaahdo ee Baashaan oo dhan, 14 iyo buuraha
dhaadheer oo dhan, iyo kuraha sare u jooga oo dhan, 15
iyo munaarad kasta oo dheer, iyo derbi kasta oo deyr leh,
16 iyo doonniyaha Tarshiish oo dhan, iyo taswiiro la jecel
yahay oo dhan. 17 Oo kibirka binu-aadmiga hoos baa loo
soo dejin doonaa, oo dadka madaxweynaantiisana waa la
hoosaysiin doonaa, oo Rabbiga keliya ayaa maalintaas la
sarraysiin doonaa. 18 Oo sanamyaduna dhammaantood
way wada baabbi'i doonaan. 19 Markii Rabbigu u soo sara
joogsado inuu dhulka si xun u gariiriyo ayay dadku cabsida
Rabbiga iyo sharafta haybaddiisa ka geli doonaan qorrofyada
dhagaxyada, iyo godadka dhulka. 20 Oo maalintaas dadku
sanamyadooda lacagta ah iyo sanamyadooda dahabka
ah oo ay u samaysteen inay caabudaan waxay u tuuri
doonaan jiirarka iyo fiidmeeraha, 21 si ay cabsida Rabbiga
iyo sharafta haybaddiisa uga galaan qorrofyada dhagaxyada
iyo qararka meelahooda dildillaacsan markii Rabbigu uu soo
sara joogsado inuu dhulka si xun u gariiriyo. 22 Ka joogsada
binu-aadmiga ay neeftiisu ku jirto dulalka sankiisa, waayo,
bal maxaa isaga lagu tiriyaa?

3 Waayo, bal eega, Sayidka ciidammada ahu wuxuu
Yeruusaalem iyo dalka Yahuudah ka qaadayaa tiirka
iyo waxa la cuskado, xataa tiirka cuntada oo dhan, iyo
tiirka biyaha oo dhan, 2 iyo ninka xoogga badan, iyo
ninka dagaalyahanka ah, iyo xaakinka, iyo nebiga, iyo
waxsheegaha, iyo odayga, 3 iyo sirkaalka konton u taliya, iyo
ninka sharafta leh, iyo lataliyaha, iyo saanaca, iyo saaxirka.
4 Oo waxaan amiirro uga dhigi doonaa carruur, oo dhallaan
baa iyaga u talin doona. 5 Oo dadkana midkood kastaba
waxaa dulmi doona mid kale, oo mid kastaba waxaa dulmi
doona deriskiisa, yarku wuxuu ku kibri doonaa odayga, oo
kan hoosena kan sharafta leh. 6 Oo markaas nin wuxuu
soo qaban doonaa walaalkiis oo jooga gurigii aabbihiis, oo
wuxuu ku odhan doonaa, Adigu waxaad leedahay dhar,
haddaba taliye noo noqo oo waxan burburka ahuna ha
kaa hooseeyo. 7 Maalintaasba wuu dhawaaqi doonaa, oo
wuxuu odhan doonaa, Anigu bogsiiye noqon maayo, maxaa
yeelay, gurigayga dhar iyo dhuuni midna laguma arko,
haddaba dadka taliye ha iiga dhigina. 8 Waayo, Yeruusaalem
waa duntay, oo dadka Yahuudahna waa dheceen, maxaa
yeelay, hadalkooda iyo falimahooduba waxay col ku yihiin
Rabbiga, oo indhihiisa ammaanta leh ayay ka cadhaysiiyaan.
9 Muuqashada wejigooda ayaa iyaga ku marag furta oo
dembigoodana way u sheegaan sidii dadkii Sodom oo kale,
oo innaba ma ay qarsadaan. Naftoodaa hoogtay! Waayo,
xumaan bay isu keeneen. 10 Waxaad sheegtaan inuu
kan xaqa ah barwaaqaysnaan doono, waayo, iyagu waxay
cuni doonaan midhihii falimahooda. 11 Waxaa hoogay kan
sharka ah, waayo, belaayaa ku dhici doonta, oo waxaa loo
samayn doonaa wixii gacmihiisu sameeyeen oo kale. 12
Laakiinse waxaa dulma dadkayga carruur, oo dumar baa
iyaga u taliya. Dadkaygow, hoggaamiyayaashaadu way
ku qaldaan, oo waxay kharribaan jidkaaga aad ku socoto.
13 Rabbigu wuxuu u sara joogaa inuu doodo, oo wuxuu
u taagan yahay inuu dadka xukumo. 14 Rabbigu wuxuu
dacwad la geli doonaa odayaasha iyo amiirrada dadkiisa.
Waa idinka kuwa dhammaystay beercanabka, wixii aad
masaakiinta ka soo dhacdeenna guryihiinnay ku dhex jiraan.
15 Sayidka ah Rabbiga ciidammadu wuxuu leeyahay, War

maxaad ula jeeddaan dadkayga aad burburinaysaan iyo
masaakiinta aad wejigooda duqaynaysaan? 16 Oo weliba
Rabbigu wuxuu yidhi, Gabdhaha Siyoon waa kibirsan yihiin,
oo waxay socdaan iyagoo madax taagan oo indhaha ku
baaqaya, oo qaadaya tallaabooyin yaryar oo degdeg ah,
dugaagadaha cagahana way ka shanqadhiyaan, 17 haddaba
sidaas daraaddeed gabdhaha Siyoon madaxooda dhaladiisa
Sayidku wuxuu u yeeli doonaa canbaar, oo wuxuu muujin
doonaa cawradooda. 18 Oo maalintaas Sayidku wuxuu
iyaga ka qaadi doonaa quruxda dugaagadaha cagahooda,
iyo shabagyada timaha, iyo bilaha, 19 iyo waxa dhegaha la
sudho, iyo sindiyada, iyo indhashareeryada, 20 iyo waxa
madaxa lagu sharraxo, iyo silsiladaha lugaha, iyo waxa
madaxa lagu xidho, iyo weelasha cadarka, iyo qardhaasaha,
21 iyo kaatummada, iyo sangelisyada, 22 iyo dharka lagu
iido, iyo shaadirrada, iyo go'yaasha, iyo boorsooyinka, 23 iyo
muraayadaha, iyo dharka wanaagsan, iyo garbasaarrada,
iyo gambooyinka. 24 Oo waxay noqon doontaa in meeshii ay
ka carfi jireen ay ka qudhmuunaan doonaan, oo meeshii ay
dhex-xidh ka xidhan jireenna xadhig bay dhexda ku xidhan
doonaan, oo meeshii ay timo wanaagsan ka lahaayeenna
waa looga xiiri doonaa, oo meeshii ay maro wanaagsan
ka guntan jireenna, joonyad bay ka guntan doonaan, oo
meeshii ay quruxda ka lahaayeenna waa laga sunti doonaa.
25 Raggaagu wuxuu ku le'an doonaa seefta, oo kuwaaga
xoogga badanuna waxay ku le'an doonaan dagaalka. 26
Oo Siyoon irdaheeduna way ooyi doonaan oo ay barooran
doonaan, oo iyadoo cidla ah ayay dhulka fadhiisan doontaa.

4 Oo maalintaas toddoba naagood ayaa isku nin qabsan
doona, oo waxay ku odhan doonaan, Annagaa
ismasruufayna oo annagaa is-arrad tirayna, ee magacaaga
keliya ha lanoogu yeedho, oo ceebtayada naga fogee. 2 Oo
maalintaas ayaa biqilka Rabbigu noqon doonaa wax qurux
iyo ammaan badan, oo midhaha dhulkuna waxay kuwa
reer binu Israa'iil oo baxsaday u noqon doonaan wax lagu
faano oo quruxsan. 3 Oo waxay noqon doontaa in kii Siyoon
ku hadhay iyo kii Yeruusaalem sii joogay loogu yeedho
quduus, xataa mid kasta oo ku qoran kuwa Yeruusaalem
ku nool dhexdooda 4 markii Sayidku maydho wasakhda
dadka Siyoon, oo uu Yeruusaalem dhiiggeeda dhexdeeda
kaga nadiifiyo ruuxa caddaaladda, iyo ruuxa wax guba. 5 Oo
meel kasta oo la deggan yahay oo Buur Siyoon ku taal,
iyo shirarkeeda oo dhanba Rabbigu wuxuu ku kor abuuri
doonaa maalintii daruur iyo qiiq, habeenkiina dab ololaya
iftiinkiis, oo ammaanta oo dhanna waxaa ka sarrayn doona
dabool. 6 Oo maalinnimada waxaa jiri doona meel kulaylka
laga hadhsado, iyo meel la galo, iyo meel laga dugsado
duufaanka iyo roobka.

5 Aan gacaliyahayga ugu gabyo gacaliyahayga gabaygiisa
oo ku saabsan beertiisa canabka ah. Gacaliyahaygu
wuxuu beer canab ah ku lahaa kur barwaaqaysan. 2 Oo
wuxuu hareereheeda ka qoday god, oo dagaxyadii ku jirayna
wuu ka saaray, markaasuu ku dhex beeray geedcanabka ugu
wanaagsan, oo dhexdeedana wuxuu ka dhisay munaarad,
oo weliba wuxuu dhexdeeda ka sameeyey god macsareed,
oo wuxuu ka sugayay in midho canab ka soo baxaan,
laakiinse waxaa ka soo baxay kuwa xunxun. 3 Haddaba,
dadka Yeruusaalem deggan iyo dadka Yahuudahow, waxaan
idinka baryayaa inaad aniga iyo beertayda canabka ah
noo kala gar qaybisaan. 4 Bal maxaa kaloo beertayda loo
samayn karay oo aanan u samayn? Maxayse markaan ka
sugayay inay midho canab ka soo baxaan kuwa xunxun uga
soo baxeen? 5 Haddaba waxaan idiin sheegayaa waxaan
beertayda canabka ah ku samayn doono: heeraarkeeda
waan ka qaadi doonaa, oo dhammaanteed way baabbi'i
doontaa, oo deyrkeedana waan dumin doonaa, oo waa lagu
joogjoogsan doonaa, 6 oo iyada waxaan ka dhigi doonaa
baabba' oo lama gooyn doono, lamana xagaafi doono,
laakiinse waxaa ka soo bixi doona yamaarug iyo qodxan, oo
weliba daruurahana waan ku amri doonaa inayan roob ku
soo dayn. 7 Waayo, Rabbiga ciidammada beercanabkiisu
waa dadka Israa'iil, oo dadka Yahuudahna waa geedkuu
ku farxo, oo wuxuu ka sugayay caddaalad, laakiinse bal
eega, waxaa ka soo baxay dhiigdaadasho oo wuxuu ka
sugayay xaqnimo, laakiinse bal eega, waxaa ka soo baxay
qaylo. 8 Hoog waxaa leh kuwa guriba guri ku dhejiya oo
beerna beer kale ku dara ilaa meel la waayo oo ay keli
ahaantood dhulka dhexdiisa degaan. 9 Rabbiga ciidammadu
wuxuu leeyahay, oo aan anigu dhegahayga ku maqlay,
Sida runta ah guryo badan baa cidloobi doona, oo xataa
kuwa waaweyn oo quruxda badanina waxay ahaan doonaan
cidla aan qofna degganayn. 10 Oo weliba toban tacab
oo beer canab ahu waxay dhali doonaan qiyaas bad la
yidhaahdo oo keliya, oo xomeer muggiis oo iniino ahuna
wuxuu dhali doonaa in eefaah qaadi karo. 11 Hoog waxaa
leh kuwa aroor hore u kaca si ay wax lagu sakhraamo u
daba galaan, oo haddana ilaa habeenkii ku sii raaga ilaa uu
khamrigu ololiyo! 12 Diyaafadahooda waxaa yaal kataarad
iyo shareerad, iyo daf iyo biibiile, iyo khamri, laakiinse
iyagu kama fiirsadaan shuqulka Rabbiga, kamana fikiraan
waxyaalihii ay gacmihiisu sameeyeen. 13 Haddaba sidaas
daraaddeed dadkaygii waxaa loo kaxaystay maxaabbiis

ahaan, maxaa yeelay, aqoon ma laha, oo raggoodii sharafta lahaa way gaajoodeen, dadkoodii badnaana oon bay la gubteen. 14 Haddaba sidaas daraaddeed She'ool calooshiisii buu isballaadhiyey, oo afkiisiina qiyaasla'aan buu u kala qaaday, oo kuwooda haybadda leh, iyo dadkooda badan, iyo kuwooda buuqa, iyo ku alla koodii reyreeyaba isagay hoos ugu dhaadhacaan. **(Sheol h7585)** 15 Oo ninka hoose baa la soo dejin doonaa, oo ninka weynna waa la hoosaysiin doonaa, oo kuwa isla weyn indhahooda waa la hoosaysiin doonaa, 16 laakiinse Rabbiga ciidammada caddaalad baa lagu sarraysiin doonaa, oo Ilaaha quduuska ahna waxaa quduus loogu tirin doonaa xaqnimo. 17 Oo markaasay baraarku daaqsintooda ikhtiyaar u daaqi doonaan, oo kuwii barwaaqaysnaana meelahooda baabba'ay waxaa cuni doona shisheeyayaal. 18 Hoog waxaa leh kuwa xumaanta ku soo jiita xadhkaha aan waxba tarayn, oo dembigana ku soo jiita jaraha gaadhiga oo kale, 19 kuwaasoo yidhaahda, Isagu ha soo dhaqsado, oo shuqulkiisana ha soo deddejiyo, si aannu u aragno aawadeed, oo Kan Quduuska ah oo reer binu Israa'iil taladiisuna ha soo dhowaato oo ha timaado, si aannu iyada u aqoonsanno aawadeed! 20 Hoog waxaa leh kuwa sharka yidhaahda waa wanaag, wanaagna yidhaahda waa shar, oo gudcurkana iftiin ku beddela, iftiinkana gudcur ku beddela, oo qadhaadhkana macaan ku beddela, macaankana qadhaadh ku beddela. 21 Hoog waxaa leh kuwa isla caqliga badan ee isla miyirka badan! 22 Hoog waxaa leh kuwa u xoogga badan inay khamri cabbaan, iyo dadka u itaalka weyn inay qasaan wax lagu sakhraamo, 23 kuwaasoo kan sharka leh xaq ka dhiga laaluush aawadiis, oo ka xaqa ahna xaqiisa ka qaada! 24 Haddaba sidaas daraaddeed sida carrabka dabku xaabka u gubo, oo uu cawskuna ololka ugu dhammaado ayaa xididkoodu u xumaan doonaa, oo ubaxooduna wuxuu u duuli doonaa sida boodh oo kale, maxaa yeelay, waxay diideen sharcigii Rabbiga ciidammada, oo waxay quudhsadeen Kan Quduuska ah oo reer binu Israa'iil eraygiisii. 25 Haddaba sidaas daraaddeed ayaa cadhadii Rabbigu dadkiisa ugu oloshay, oo wuxuu iyaga ku soo fidiyey gacantiisii, wax buuna ku dhuftay, oo buurihiina way wada gariireen, oo meydadkoodiina jidadkay dhex daadsanaayeen sida qashin oo kale, hase ahaatee cadhadiisa kama uu sii jeedin, laakiinse gacantiisu weli way sii fidsan tahay. 26 Oo isna meel fog ayuu calan uga taagi doonaa quruumaha, oo wuxuu iyaga uga foodhyi doonaa dhulka dhammaadkiisa, oo bal eega, dhaqsay u iman doonaan. 27 Midkoodna ma daali doono, mana kufi doono, oo midkoodna ma gam'i doono, mana seexan doono, dhex-xidhkuna ma furmi doono, yeelmaha kabahooduna ma go'i doono. 28 Fallaadhahoodu waa af miidhan, oo qaansooyinkooda oo dhammuna waa wada xodan yihiin, oo qoobabka fardahoodana waxaa la moodaa sida dhagaxmadow oo kale, oo giraangirahooduna waa sida cirwareenta oo kale, 29 oo cidoodu waxay ahaan doontaa sida gool cideed, oo waxay u ciyi doonaan sida libaaxyo yaryar oo kale; hubaal way ciyi doonaan, wayna qabsan doonaan waxay ugaadhsanayaan, oo si ammaan ah ayay u qaadan doonaan, oo ciduna kama samatabbixin doonto. 30 Oo maalintaas waxay iyaga ugu gurxami doonaan sida gurxanka badda; oo haddii dalka la eegana waxaa ka muuqda gudcur iyo cidhiidhi, oo iftiinkuna waa ku dhex madoobaaday daruurihii.

**6** Sannaddii Boqor Cusiyaah dhintay ayaan arkay Rabbiga oo ku fadhiya carshi sare oo dheer, oo faraqii dharkiisa ayaa macbudkii buuxiyey. 2 Oo meel isaga ka sarraysayna waxaa taagnaa seraafiim, oo midkood kastaaba wuxuu lahaa lix baal, laba wejigiisuu ku deday, labana cagihiisuu ku deday, labana wuu ku duulay. 3 Oo midba wuxuu u qaylinayay midka kale, oo waxay lahaayeen, Quduus, quduus, quduus waxaa ah Rabbiga ciidammada, oo dhulka oo dhanna waxaa ka buuxda ammaantiisa. 4 Oo aasaaska iridda ayaa la gariiray kii qayliyey codkiisii, oo gurigiina waxaa ka buuxsamay qiiq. 5 Markaasaan idhi, Anaa hoogay! Waayo, waan lumay, maxaa yeelay, waxaan ahay nin aan bushimihiisu daahirsanayn, oo weliba waxaan dhex degganahay dad aan bushimahoodu daahirsanayn, waayo, indhahaygu waxay arkeen Boqorka ah Rabbiga ciidammada. 6 Markaasaa seraafiimtii midkood xaggayga u soo duulay isagoo gacanta ku sida dhuxul nool, oo uu birqaab kaga soo qaaday meeshii allabariga, 7 oo intuu dhuxushii afkayga taabsiiyey ayuu igu yidhi, Bal eeg, tanu waxay taabatay bushimahaaga, oo xumaantaadii waa lagaa qaaday, oo dembigaagiina waa lagaa kafaaragguday. 8 Oo weliba waxaan maqlay codkii Rabbiga oo leh, Yaan diraa? Yaase noo tegaya? Markaasaan idhi, Waa i kane aniga i dir. 9 Oo wuxuu igu yidhi, Tag, oo dadkan waxaad ku tidhaahdaa, Wax sii maqla, mana garan doontaan, oo wax sii arka, idiinmana dhaadhici doonto. 10 Dadkan qalbigooda ka dhig mid qallafsan, dhegahoodana kuwa dhib wax ku maqla, indhahoodana kuwa xidhan, si aanay indhaha wax ugu arkin, oo aanay dhegaha wax ugu maqlin, oo aanay qalbiga wax ugu garan, oo aanay u soo noqon, oo aanay u bogsan. 11 Markaasaan idhi, Sayidow, waa ilaa goorma? Oo isna wuxuu iigu jawaabay, Waa ilaa magaalooyinku baabba'aan oo wax deggan laga waayo, oo guryuhuna ay noqdaan cidla, oo dalkuna uu dhammaantiis wada baabba'o, 12 oo Rabbigu dadka ka fogeeyo, oo ay dhulka ku bataan meelo badan oo

laga tegey. 13 Oo haddii dhexdiisa toban meelood meel ku
hadho way baabbi'i doontaa, oo sida geedo marka la gooyo
jiridu u hadho ayaa farcanka quduuska ahu dadka jirid u
yahay.

7 Oo Aaxaas ina Yootan, ina Cusiyaah, oo ahaa boqorkii
dalka Yahuudah wakhtigiisii waxaa Yeruusaalem ku
soo kacay Resiin oo ahaa boqorkii Suuriya iyo Feqax
ina Remalyaah oo ahaa boqorkii dalka Israa'iil inay la
diriraan, laakiinse way ka adkaan kari waayeen. 2 Oo
waxaa reer Daa'uud loo soo sheegay war leh, Suuriya
waxay xidhiidh la yeelatay reer Efrayim. Markaasaa qalbigiisii
iyo qalbigii dadkiisuba waxay u ruxmadeen sida geedaha
duurka dabayshu u ruxdo oo kale. 3 Markaasaa Rabbigu
wuxuu Ishacyaah ku yidhi, Adiga iyo wiilkaaga She'aar
Yaashuubba taga oo waxaad Aaxaas uga hor tagtaan
meeshuu biyomareenka balliga sare ku dhammaado kaasoo
ku dhex yaal waddada berrinka dharmaydhaha, 4 oo waxaad
isaga ku tidhaahdaa, Digtoonow oo xasilloonow, ha cabsan,
hana qalbi jabin labadan qori ee dabka ah ee qiiqaya
aawadood, ha ka welwelin cadhada kulul oo Resiin iyo
Suuriya, iyo tan ina Remalyaah toona. 5 Suuriya, iyo Efrayim,
iyo ina Remalyaah waxay kuugu tashadeen talo xun, oo
waxay isku yidhaahdeen, 6 Ina keena aynu dalka Yahuudah
ku kacnee oo dhibnee, aynuna jabsanno, oo dhexdiisa boqor
fadhiisinno, kaasoo ah ina Taabeel, 7 taas daraaddeed
Sayidka Rabbiga ahu wuxuu leeyahay, Taladaasu hagaagi
mayso, mana ahaan doonto. 8 Waayo, Suuriya madaxeedu
waa Dimishaq, oo Dimishaq madaxeeduna waa Resiin, oo
reer Efrayimna waxay ku kala jajabi doonaan muddo ah
shan iyo lixdan sannadood si aanay innaba dad u sii ahaan,
9 oo reer Efrayim madaxoodu waa Samaariya, oo Samaariya
madaxeeduna waa ina Remalyaah. Haddaad rumaysan
weydaan, sida xaqiiqada ah sinaba ma xoogaysan doontaan.
10 Oo weliba Rabbigu mar kaluu Aaxaas la sii hadlay,
oo wuxuu ku yidhi, 11 Rabbiga Ilaahaaga ah calaamad
weyddiiso, oo waxaad ka weyddiisataa meelaha hoose ama
meelaha sare. **(Sheol h7585)** 12 Oo Aaxaasna wuxuu yidhi,
Anigu waxba weyddiisan maayo, oo Rabbigana innaba
jirrabi maayo. 13 Oo isna wuxuu yidhi, Reer Daa'uudow, bal
haatan i maqla, ma wax yar bay idinku tahay inaad dadka
daalisaan? Oo weliba Ilaahaygana miyaad daalinaysaan? 14
Haddaba Rabbiga qudhiisa ayaa calaamad idin siin doona.
Bal ogaada, gabadh bikrad ah baa uuraysan doonta, oo
waxay dhali doontaa wiil, oo magiciisana waxay u bixin
doontaa Cimmaanuu'eel. 15 Wuxuu cuni doonaa subag iyo
malab, ilaa uu aqoonsado inuu sharka diido oo wanaagga
doorto. 16 Waayo, intaan yarku aqoonsan inuu diido sharka
oo uu wanaagga doorto ayaa dalka aad labadiisa boqor
karaahiyaysatoba laga tegi doonaa. 17 Adiga, iyo dadkaaga
iyo reerka aabbahaaba waxaa Rabbigu ku soo dejin doonaa
wakhti aan idiin iman tan iyo waa reer Efrayim ay dalka
Yahuudah ka tageen, oo kaasuna waa kii boqorka Ashuur. 18
Oo weliba maalintaas Rabbigu wuxuu u soo foodhyi doonaa
diqsiyada jooga webiyada Masar darafka ugu shisheeya,
iyo shinnida joogta dalka Ashuur. 19 Oo iyana way iman
doonaan, oo kulligood waxay ku degi doonaan dooxooyinka
cidlada, iyo godadka dhagaxyada, iyo geedaha qodxanta leh
oo dhan, iyo meelaha daaqsinta ah oo dhan. 20 Oo isla
maalintaas ayaa Rabbigu madaxa iyo xataa lugahaba ku xiiri
doona mandiil laga soo kiraystay webiga shishadiisa, taasoo
ah boqorka Ashuur, waxayna baabba' ka dhigi doontaa
gadhka. 21 Oo waxay maalintaas noqon doontaa in nin
dhaqaalaysto sac iyo laba laxaad, 22 oo caanaha tirada
badan oo uu ka heli doono aawadood ayuu subag cuni
doonaa, waayo, mid kasta oo dalka ku hadhayba wuxuu
quudan doonaa subag iyo malab. 23 Oo waxay maalintaas
noqon doontaa in meel kasta oo ay ku yiilleen kun geed oo
canab ah oo kun xabbadood oo lacag ah lagu qiimeeyo, ay
noqoto meel ay ka soo baxaan yamaarug iyo qodxan. 24 Oo
waxaa halkaas lala iman doonaa fallaadho iyo qaansooyin,
maxaa yeelay, dalka oo dhammu wuxuu noqon doonaa
yamaarug iyo qodxan miidhan. 25 Oo kurihii sabaradda lagu
qodi jiray oo dhan innaba ma aad iman doontaan xaggooda,
waana cabsi aad ka qabtaan yamaarugga iyo qodxanta,
laakiinse waxay noqon doonaan meel dibida lagu sii daayo
daaqaan iyo meel iduhu ku tuntaan.

8 Oo Rabbigu wuxuu igu yidhi, Waxaad soo qaadataa
loox weyn, oo waxaad farta dadka ku qortaa. Maheer-
shaalaal-haash-bas, 2 oo anna waxaan markhaatiyaal aamin
ah u soo wadi doonaa wadaadkii Uuriyaah iyo Sekaryaah ina
Yeberekyaah. 3 Markaasaan u tegey nebiyaddii oo iyana way
uuraysatay, oo waxay dhashay wiil. Kolkaasaa Rabbigu igu
yidhi, Waxaad magiciisa u bixisaa, Maheer-shaalaal-haash-
bas. 4 Waayo, intaan yarku baran inuu yidhaahdo, Aabbe
iyo Hooyo ka hor ayaa boqorka Ashuur maalka Dimishaq iyo
xoolaha boolida ah oo Samaariyaba wada qaadan doonaa.
5 Oo haddana Rabbigu waa ila hadlay, oo wuxuu igu yidhi, 6
Dadkanu way diideen biyaha Shilo'ax oo qunyar socda, oo
waxay ku reyreeyaan Resiin iyo ina Remalyaah, 7 haddaba
sidaas daraaddeed Sayidku wuxuu ku soo dayn doonaa
biyaha Webiga ee xoogga iyo badnaanta leh, kuwaasoo ah
boqorka Ashuur iyo sharaftiisa oo dhan, oo isna faraqyadiisa

oo dhan wuu soo buuxin doonaa, oo qararkiisa oo dhanna
wuu buuxdhaafin doonaa, 8 oo aad buu u socon doonaa ilaa
uu galo dalka Yahuudah, oo intuu wada buuxdhaafo ayuu
dhex mari doonaa, oo wuxuu gaadhi doonaa ilaa luqunta,
kalafidinta baadadkiisu waxay buuxin doontaa ballaadhka
dalkaaga oo dhan Cimmaanuu'eelow. 9 Dadyowgow, qayliya,
waadna jajabi doontaan, kuwiinna dalalka fogow, dhegaysta,
guntiga isku dhuujiya, waadna jajabi doontaan, guntiga
isku dhuujiya, waadna jajabi doontaan. 10 Kulligiin isla
tashada, taladiinnuna way buri doontaa, erayga ku hadla,
mana hagaagi doono, waayo, Ilaah baa nala jira. 11 Waayo,
Rabbigu sidaasuu igula hadlay, isagoo gacan xoog badan
leh, oo wuxuu iiga digay inaanan ku socon jidka dadkanu
ay ku socdaan, wuxuuna igu yidhi, 12 Ha odhanina, Waa
fallaagow waxa dadkanu fallaagow yidhaahdaan oo dhan,
hana ka cabsanina wixii ay ka cabsadaan, oo innaba ha
argaggixina. 13 Quduus ka dhiga Rabbiga ciidammada,
oo isagu ha ahaado kan aad ka cabsataan oo aad ka
argaggaxdaanba. 14 Oo wuxuu ahaan doonaa meel quduus
ah, laakiinse labada qoys oo reer binu Israa'iilba wuxuu u
noqon doonaa dhagax lagu turunturoodo iyo sallax lagu
xumaado, oo dadka Yeruusaalem degganna wuxuu u noqon
doonaa dabin iyo siriq. 15 Oo kuwa badan ayaa turunturoon
doona, oo kufi doona, oo jebi doona, waana la dabi doonaa,
oo la qabsan doonaa. 16 Markhaatifurka xidh, oo sharcigana
xertayda dhexdeeda ku shaabadee. 17 Anigu waxaan sugi
doonaa Rabbiga wejigiisa dadka Yacquub ka qariya, oo
isagaan filan doonaa. 18 Bal eega, aniga iyo carruurta
Rabbigu i siiyeyba waxaannu reer binu Israa'iil u nahay
calaamado iyo yaabab ka yimid xagga Rabbiga ciidammada
oo deggan Buur Siyoon. 19 Oo markay idinku leeyihiin, Talo
weyddiista kuwa ruuxaanta leh, iyo saaxiriinta hadaaqda oo
guryanta, miyaanay dadka waajib ku ahayn inay Ilaahooda
talo weyddiistaan? Miyayse iyaga ku habboon tahay inay
kuwa dhintay wax u weyddiiyaan kuwa nool aawadood? 20
Sharciga iyo markhaatifurka ka fiirsada, oo eraygan hadal
waafaqsan haddaanay ku hadlinna hubaal iyaga waaberi
uma jiri doono. 21 Oo iyagoo dhibaataysan oo gaajaysan
ayay dalka dhex mari doonaan, oo markay gaajoodaan
ayay isku xanaaqi doonaan, oo waxay habaari doonaan
boqorkooda oo wax xun Ilaahooda ka sheegi doonaan,
xagga sarena way u jeedsan doonaan, 22 dhulkana way
fiirin doonaan, oo bal eega, waxay ku arki doonaan dhib iyo
gudcur, iyo cidhiidhiga madowgiisa, oo waxaa iyaga lagu
eryi doonaa gudcur dam ah.

9 Habase ahaatee madow uma ahaan doono tii cidhiidhiga
ku jirtay. Waagii hore wuxuu ka dhigay in la quudhsado
dhulka Sebulun iyo dhulka Naftaali, laakiinse waagii dambe
wuxuu ka dhigay in la sharafo dhulka ah xagga jidka badda,
iyo Webi Urdun shishadiisa, iyo Galili quruumaha ka mid
ah. 2 Dadkii ku socon jiray gudcurka ayaa iftiin weyn arkay,
kuwii fadhiyi jiray dalka hooska dhimashada ahna iftiin baa u
baxay. 3 Adigu quruunta waad badisay, oo farxaddoodiina
waad sii kordhisay, oo waxay hortaada ugu farxaan sida
farxadda wakhtiga beeraha la goosto, iyo sida niman booli
qaybsanayaa ay u reyreeyaan oo kale. 4 Waayo, harqoodkii
ku cuslaa, iyo hangoolkii garbaha lagaga dhufan jiray, iyo
ushii kii dulmi jiray, ayaad jebisay sidii waagii reer Midyaan.
5 Waayo, ninka hubka leh ee buuqa ku dhex jira hubkiisa
oo dhan iyo dharka dhiigga miidhanna waa la gubi doonaa
oo waxaa laga dhigi doonaa wax dabka lagu shido. 6
Waayo, waxaa inoo dhashay ilmo, waxaa layna siiyey wiil,
oo boqornimadu garbihiisay saarmi doontaa, oo magiciisana
waxaa loo bixin doonaa Ka Yaabkaleh, iyo Lataliye, iyo
Ilaaha Xoogga leh, iyo Aabbaha Daa'imka ah, iyo Amiirka
Nabadda. 7 Oo boqornimadiisa iyo nabaddu way badnaan
doonaan, dhammaadna uma lahaan doonaan carshiga
Daa'uud iyo boqortooyadiisa, in la sii adkeeyo, oo caddaalad
iyo xaqnimo lagu sii hayo haatan iyo tan iyo weligeedba. Oo
tan waxaa samayn doona qiirada Rabbiga ciidammada. 8
Sayidku wuxuu eray u soo diray dadka Yacquub wuxuuna
ku kor dhacay dadka Israa'iil. 9 Oo waxaa garan doona
dadka oo dhan, xataa reer Efrayim iyo kuwa Samaariya
deggan oo kibirka iyo islaweynaanta qalbiga ku hadla, iyagoo
leh, 10 Lebennadii way soo dheceen, laakiinse annagu
waxaannu ku dhisi doonnaa dhagaxyo la qoray, geedihii
darayga ahaa waa la jaray, laakiinse waxaannu ku beddeli
doonnaa geedo kedar ah. 11 Haddaba sidaas daraaddeed
Rabbigu wuxuu ku soo kicin doonaa kuwa Resiin la col ah,
oo cadaawayaashiisana wuu isku soo wada ururin doonaa
dhammaantood, 12 wuxuu reer Suuriya ka soo kicin doonaa
xagga bari, reer Falastiinna xagga galbeed, oo waxay dadka
Israa'iil ku cuni doonaan af furan. Hase ahaatee cadhadiisa
kama uu sii jeedin, laakiinse gacantiisii weli way fidsan
tahay. 13 Laakiinse dadku uma ay soo noqon kii iyaga wax
ku dhuftay, mana ay doondoonin Rabbiga ciidammada. 14
Haddaba sidaas daraaddeed Rabbigu maalin keliya ayuu
dadka Israa'iil ka jari doonaa madaxa iyo dabadaba, iyo
laanta iyo cawsduurkaba. 15 Odayga iyo kan sharafta lahu
waa madaxa, oo nebiga dadka beenta baraana waa dabada.
16 Waayo, dadkan hoggaamiyayaashoodu way qaldaan, oo
kuwa la hoggaamiyaana way wada baabba'aan. 17 Haddaba

sidaas daraaddeed Sayidku ku farxi maayo barbaarradooda,
oo agoontooda iyo carmalladoodana u naxariisan maayo,
waayo, midkood kastaaba waa cibaadalaawe iyo xumaanfale,
oo af kastaana wuxuu ku hadlaa wax nacasnimo ah. Hase
ahaatee cadhadiisa kama uu sii jeedin, laakiinse gacantiisii
weli way fidsan tahay. **18** Waayo, xumaantu waxay wax
u gubtaa sida dabka oo kale, oo waxay dam ka dhigtaa
yamaarugga iyo qodxanta, oo jiqda duuddana way ololisaa,
oo waxaa kor uga baxa daruur qiiq ah. **19** Dhulku wuxuu la
gubtay Rabbiga ciidammada cadhadiisa, oo dadkuna waxay
yihiin sida wax dabka lagu shido, oo ninna walaalkiis ma
caymiyo. **20** Xagga gacanta midig ayaa wax laga dhufsan
doonaa, waana la sii gaajoon doonaa, xagga gacanta
bidixna wax baa lagu cuni doonaa, lamana dhergi doono, oo
midkood kastaaba wuxuu cuni doonaa hilibka gacantiisa.
**21** Reer Manaseh waxay cuni doonaan reer Efrayim, oo
reer Efrayimna waxay cuni doonaan reer Manaseh, oo
iyana dhammaantood waxay col ku ahaan doonaan reer
Yahuudah. Hase ahaatee cadhadiisa kama uu sii jeedin,
laakiinse gacantiisii weli way fidsan tahay.

**10** Hoog waxaa leh kuwa amarro aan xaq ahayn soo
saara, iyo kuwa wax qalloocan qora, **2** inay kuwa
baahan garta ka qalloociyaan oo ay masaakiinta dadkaygana
xaqooda ka qaadaan, oo ay carmallada ka dhigaan waxa
ay dhacaan agoontana waxa ay ugaadhsadaan. **3** Oo bal
maxaad samayn doontaan maalinta ciqaabta, iyo wakhtiga
baabbi'intu meesha fog ka iman doonto? Bal yaad u
magangeli doontaan? Sharaftiinnana xaggee baad kaga tegi
doontaan? **4** Waxay ku dhex foororsan doonaan maxaabiista,
oo waxay ku dhex dhici doonaan kuwa la layn doono. Hase
ahaatee cadhadiisa kama uu sii jeedin, laakiinse gacantiisii
weli way fidsan tahay. **5** Hoog waxaa leh ka reer Ashuur oo ah
ushii cadhadayda iyo hangoolka dhirifkaygu gacanta ugu jiro.
**6** Isagaan u diri doonaa inuu quruun cibaadalaawayaal ah ku
kaco, oo waxaan ku amri doonaa amar ka gees ah dadka
aan u cadhooday, inuu maalkooda dhaco, oo uu maxaabiis
kexeeyo, oo uu iyaga ugu tunto sida dhoobada jidadka
dhex taal. **7** Habase ahaatee isagu saas kuma talo jiro, oo
qalbigiisuna saas kuma fikiro, laakiinse waxaa qalbigiisa ku
jira inuu baabbi'iyo oo jaro quruumo aan yarayn. **8** Waayo,
isagu wuxuu leeyahay, Amiirradaydu dhammaantood sow
boqorro ma aha? **9** Kalnoo sow ma aha sida Karkemiish?
Xamadna sow ma aha sida Arfaad? Samaariyana sow ma
aha sida Dimishaq oo kale? **10** Sidii ay gacantaydu u gaadhay
boqortooyooyinkii sanamyada, oo ay taswiirahoodii la xardhay
ka sii badnayeen kuwa Yeruusaalem iyo Samaariya, **11** iyo
sidii aan Samaariya iyo sanamyadeedii ku sameeyey oo kale,
miyaanan Yeruusaalem iyo sanamyadeedaba ku samayn
doonin? **12** Sidaas daraaddeed markii Sayidku shuqulkiisa
oo dhan ku dhammaystiro Buur Siyoon iyo Yeruusaalem,
wuxuu odhan doonaa, Boqorka Ashuur ayaan u ciqaabi
doonaa midhaha qalbigiisa isla weyn iyo faanka indhihiisa
kibrayba. **13** Waayo, isagu wuxuu yidhi, Tan waxaan ku
sameeyey xoogga gacantayda iyo xigmaddayda, maxaa
yeelay, miyir baan leeyahay, oo waxaan durkiyey dadyowga
soohdintooda, khasnadahoodiina waan dhacay, oo sidii nin
geesi ah oo kale ayaan kuwii carshiyada ku fadhiyey u
soo dejiyey. **14** Oo gacantayduna waxay maalkii dadka u
heshay sidii buul shimbireed oo kale, oo sida loo soo ururiyo
ukumo laga tegey ayaan u soo ururiyey dhulka oo dhan, oo
lamana arag mid baal dhaqaajiyey, ama afka kala qaaday,
amase ciyey. **15** Miyuu faasku ka faanaa kan isaga wax ku
gooya? Minshaartuna miyey iska sii weynaysaa kan iyada
ku shaqeeya? Waa sida haddii ulu iska gilgisho kuwa iyada
kor u qaada, amase sida hangool kor u qaada kan aan qori
ahayn? **16** Haddaba sidaas daraaddeed Sayidka ah Sayidka
ciidammadu wuxuu kuwiisa cayilay ku soo diri doonaa
macaluul, oo sharaftiisa meesheedana waxaa lagu shidi
doonaa olol ah sida olol dabeed. **17** Iftiinka Israa'iilna wuxuu
noqon doonaa dab, oo kiisa Quduuska ahuna olol, oo maalin
qudha ayuu gubi doonaa oo baabbi'in doonaa qodxantiisa iyo
yamaaruggiisba, **18** oo wuxuu dhammayn doonaa ammaanta
duuddiisa iyo beertiisa midhaha badanba, iyo naf iyo jidhba,
oo waxay noqon doontaa sidii markii calanqaade taag
darnaado. **19** Oo geedaha duuddiisa ku hadhayna waxay
noqon doonaan in yar oo ilma yaru tiradooda qori karo. **20**
Oo waxay maalintaas noqon doontaa in kuwa dadka Israa'iil
ka hadhay iyo intii dadka Yacquub ka baxsatayba ayan
mar dambe ku tiirsan kii iyaga wax ku dhuftay, laakiinse
waxay si run ah ugu tiirsan doonaan Rabbiga ah Kan
Quduuska ah oo dadka Israa'iil. **21** Qaar hadhay baa soo
noqon doona, xataa qaar hadhay oo dadka Yacquub waxay
u soo noqon doonaan Ilaaha xoogga badan. **22** Israa'iilow, in
kastoo dadkaagu u badan yahay sida cammuudda badda,
qaar yar oo qudha ayaa soo noqon doona, oo baabba'
la soo amray ayaa caddaalad la qarqi doona. **23** Waayo,
Sayidka ah Rabbiga ciidammadu wuxuu baabbi'id la amray
ku samayn doonaa dhulka dhexdiisa oo dhan. **24** Haddaba
sidaa daraaddeed Sayidka ah Rabbiga ciidammadu wuxuu
leeyahay, Dadkayga Siyoon degganow, kan reer Ashuur ha
ka baqin. Ushiisuu kugu dhufan doonaa, oo hangoolkiisuu
kuu qaadan doonaa sida Masriyiintu sameeyeen oo kale, **25**
laakiin, weli wakhti yar baa hadhay, dabadeedna dhirifkaygu

wuu idlaan doonaa, oo cadhadayduna way ku dhammaan
doontaa baabba'ooda. 26 Oo Rabbiga ciidammaduna
wuxuu iyaga ku ciqaabi doonaa karbaash u gala sida
layntii reer Midyaan oo ka dhacday dhagixii weynaa ee
Xoreeb agtiisa, oo sida ushiisu u kor ahayd badda ayuu
kor ugu qaadi doonaa sidii Masar loogu qaaday oo kale.
27 Oo maalintaas rarkiisa ayaa garbahaaga laga qaadi
doonaa, oo harqoodkiisana surkaagaa laga dejin doonaa, oo
harqoodkuna wuxuu u baabbi'i doonaa saliidda aawadeed.
28 Cayaad buu yimid, oo Migroon buu dhex maray, oo wuxuu
alaabtiisii dhigtay Mikmaash. 29 Way gudbeen meeshii laga
gudbi jiray, oo waxay ku dhaxeen Gebac. Raamaah way
gariirtay, Gibecaahdii Saa'uulna way carartay. 30 Magaalada
Galliimay, codkaaga kor u qaad! Layishay, maqal! Adaa
hoogay, Canaatooday! 31 Madmeenaah way carartay, oo
dadkii Gebiim degganaana waxay isu soo urursadeen inay
baxsadaan. 32 Maantadan wuxuu soo joogsan doonaa Nob,
oo wuxuu gacantiisa ku ruxayaa buurta magaalada Siyoon
oo ah kurta Yeruusaalem. 33 Bal eega, Sayidka ah Rabbiga
ciidammadu wuxuu laamaha u gooyn doonaa si aad loogaga
cabsado, oo kuwa waaweynna waa la jari doonaa, oo kuwa
dhaadheerna waa la ridi doonaa. 34 Oo jiqda duuddana bir
buu ku jari doonaa, oo Lubnaanna waxay ku dhici doontaa
mid xoog badan gacantiis.

**11** Oo jiridda Yesay biqil baa ka soo biqli doona, oo
xididdadiisana laan baa ka soo dhalan doonta, 2 oo
waxaa ku dul joogi doona Ruuxa Rabbiga oo ah ruuxa
xigmadda iyo waxgarashada, iyo ruuxa talada iyo xoogga,
iyo ruuxa aqoonta iyo ka cabsashada Rabbiga. 3 Wuxuuna
ku farxi doonaa Rabbiga ka cabsashadiisa, oo isagu wax
uma xukumi doono siduu wax u arko, oo siduu wax u
maqlana innaba uma gar gooyn doono, 4 laakiin masaakiinta
wuxuu ugu gar qaybin doonaa xaqnimo, oo dhulka kuwiisa
hooseeyana wuxuu ugu gar gooyn doonaa caddaalad,
oo wuxuu dhulka ku dhufan doonaa usha afkiisa, oo kan
sharka lehna wuu ku dili doonaa neefta bushimihiisa. 5
Wuxuu dhexda ku xidhan doonaa xaqnimo, miskihiisana
wuxuu ku xidhan doonaa aaminnimo. 6 Oo yeydu waxay
la joogi doontaa baraarka, shabeelkuna wuxuu la jiifsan
doonaa waxarta, oo weysha iyo dhasha libaaxa iyo neefka
buuranu way wada joogi doonaan, oo waxaa iyaga hor kici
doona ilma yar. 7 Oo waxaa wada daaqi doona saca iyo
orsada, oo ubadkooduna way isla wada jiifsan doonaan,
oo libaaxuna sida dibiga oo kale caws buu u cuni doonaa.
8 Oo caanonuuggu wuxuu ku dul cayaari doonaa godka
jilbiska, ilmaha naaska laga gudhiyeyna wuxuu gacantiisa
saari doonaa hogga abeesada. 9 Oo buurtayda quduuska
ah oo dhan, waxba kuma yeeli doonaan, waxna kuma
baabbi'in doonaan, waayo, dhulka waxaa ka buuxsami
doona aqoonta Rabbiga, siday biyuhu badda uga buuxaan.
10 Oo maalintaas xididka Yesay ayaa dadyowga calan u
ahaan doona. Isagay quruumuhu doondooni doonaan, oo
rugtiisuna ammaan bay ahaan doontaa. 11 Oo maalintaas
ayuu Sayidku gacantiisa mar labaad u soo fidin doonaa
inuu dadkiisa hadhay ka soo celiyo Ashuur iyo Masar, iyo
Fatroos, iyo Kuush, iyo Ceelaam, iyo Shincaar, iyo Xamaad,
iyo gasiiradaha baddaba. 12 Oo calan ayuu quruumaha u
taagi doonaa, wuxuuna soo shirin doonaa masaafurisyadii
dadka Israa'iil, oo wuxuu isu soo ururin doonaa oo dhulka
afartiisa daraf ka soo kaxayn doonaa kuwa kala firdhay oo
dadka Yahuudah. 13 Oo weliba hinaasada reer Efrayim
wuu idlaan doonaa, oo kuwa dadka Yahuudah dhibana waa
la jari doonaa, reer Efrayim kuma hinaasi doonaan dadka
Yahuudah, oo dadka Yahuudahna reer Efrayim ma dhibi
doonaan. 14 Way duuli doonaan oo ku degi doonaan garbaha
reer Falastiin xagga galbeed jooga, oo waxay wadajir u
dhici doonaan dadka reer bari, gacantooday saari doonaan
reer Edom iyo reer Moo'aab, oo reer Cammoonna iyagay
addeeci doonaan. 15 Oo Rabbigu wuxuu dhammaantiis
wada baabbi'in doonaa carrabka badda Masar, oo gacantiisa
oo dabayl xoog leh wadata ayuu ku kor ruxi doonaa Webiga,
oo intuu wax ku dhufto ayuu toddoba faraq u kala qaybin
doonaa, oo wuxuu ka dhigi doonaa in dadku kabo kaga
gudbaan. 16 Oo dadkiisa hadhay waxaa u jiri doona jid weyn
oo ka yimaada xagga Ashuur, sidii uu reer binu Israa'iilba
ugu jiray waagii ay dalkii Masar ka soo baxeen.

**12** Oo maalintaas waxaad odhan doontaa, Rabbiyow,
waan kuu mahadnaqayaa, waayo, in kastoo aad ii
cadhaysnayd, cadhadaadii way iga rogmatay oo waad i qalbi
qaboojisay. 2 Bal eega, Ilaah waa badbaadadayda! Waan
isku hallayn doonaa, mana baqi doono, waayo, Rabbiga
Ilaaha ahu waa xooggayga iyo gabaygayga, oo weliba
wuxuu ii noqday badbaadadayda. 3 Haddaba farxad baad
biyo kaga dhaansan doontaan ceelasha badbaadada. 4 Oo
maalintaas waxaad odhan doontaan, Rabbiga u mahadnaqa,
oo magiciisa ku barya, falimihiisana ka caddeeya dadyowga
dhexdooda, oo xusuusiya inuu magiciisu weyn yahay.
5 Rabbiga u gabya, waayo, waxyaalo waaweyn ayuu
sameeyey, dunida oo dhanna taas ogeysiiya. 6 Kuwiinna
Siyoon degganow, aad u qayliya oo dhawaaqa, waayo, Kan
Quduuska ah oo reer binu Israa'iil ee dhexdiinna joogaa wuu
weyn yahay.

**13** Kanu waa warka culus ee Baabuloon ku saabsan oo
uu Ishacyaah ina Aamoos arkay. **2** Buurta dheer calan
ka taaga, codkana iyaga kor ugu qaada, oo u gacanhaadiya
inay irdaha kuwa gobta ah galaan. **3** Waxaan amray
kuwaygii gooni la iigu dhigay, oo weliba waxaan cadhadayda
aawadeed ugu yeedhay kuwayga xoogga badan, waxaana
weeye kuwa sarrayntayda ku reyreeya. **4** Waxaa la maqlayaa
bulxanka dadka badan oo buuraha ka yeedhaya sida dad
fara badan! Waxaana la maqlayaa buuqa boqortooyooyinkii
quruumaha isa soo wada urursaday! Rabbiga ciidammadu
wuxuu soo ururinayaa ciidanka dagaalka. **5** Waxay ka
imanayaan waddan fog iyo samada darafka ugu shisheeya
inay dalka oo dhan baabbi'iyaan, waana Rabbiga iyo hubkii
dhirifkiisaba. **6** Baroorta, waayo, maalintii Rabbigu way dhow
dahay, oo waxay u iman doontaa sida baabbi'in xagga Ilaaha
Qaadirka ah ka timid. **7** Haddaba sidaas daraaddeed gacmo
oo dhammu way taag gabi doonaan, oo nin kastaba qalbigiisu
wuu dhalaali doonaa. **8** Wayna nixi doonaan, oo waxaa
qaban doona xanuun iyo murug, oo waxay u xanuunsan
doonaan sida naag foolanaysa. Oo midkoodba kan kaluu la
yaabi doonaa, oo wejigooduna wuxuu noqon doonaa sida olol
oo kale. **9** Bal eega, maalinta Rabbigu way imanaysaa iyadoo
nac weyn oo ka buuxda cadho iyo xanaaq kulul si dhulka
cidla looga dhigo oo dembilayaasha oo dhan dhexdiisa looga
baabbi'iyo. **10** Waayo, xiddigaha samada iyo ururkooduba
ma iftiimi doonaan. Qorraxduna way madoobaan doontaa
markii ay soo baxdo, oo dayaxuna ma iftiimi doono. **11**
Oo dunida sharkeeda aawadiis ayaan u ciqaabi doonaa,
oo kuwa sharka lehna xumaantooda aawadeed ayaan u
ciqaabi doonaa, oo kuwa kibrana kibirkooda waan joojin
doonaa, oo kuwa laga cabsadona madaxweynaantooda
hoos baan u soo dejin doonaa. **12** Waxaan dadka ka dhigi
doonaa wax dhif ah oo ka qaalisan dahabka wanaagsan, oo
binu-aadmigana waxaan ka dhigi doonaa wax aan badnayn
sida dahabka saafiga ah ee Oofir. **13** Haddaba sidaas
daraaddeed maalinta Rabbiga xanaaqiisa kululu iman doono
ayaan samooyinka gariirin doonaa, dhulkuna meeshiisuu
kaga dhaqaaqi doonaa cadhada Rabbiga ciidammada. **14**
Oo sida deero la eryay iyo sida ido aan ciduna soo ururin
ayaa midkood kastaaba dadkiisa ku noqon doonaa, oo
mid kastaaba dalkiisa u carari doonaa. **15** Mid kasta oo la
helo waa la dooxi doonaa, oo mid kasta oo la qabto seef
baa lagu dili doonaa. **16** Oo dhallaankoodana dhulkaa lagu
tuuri doonaa iyagoo arkaya, guryahoodana waa la dhici
doonaa, naagahoodana waa la kufsan doonaa. **17** Bal eega,
waxaan iyaga ku soo kicin doonaa reer Maaday oo aan
innaba lacag ka fikirayn oo aan dahabkana ku farxin. **18**
Qaansooyinkoodu waxay baabbi'in doonaan barbaarrada, oo
midhaha maxalkana innaba uma ay naxariisan doonaan, oo
carruurtana uma ay tudhi doonaan. **19** Oo Baabuloon oo ah
sharaftii boqortooyooyinka iyo quruxdii kibirka reer Kaldayiin
waxay noqon doontaa sidii markii Ilaah Sodom iyo Gomora
afgembiyey. **20** Oo weligeed innaba lama degi doono oo
tan iyo ab ka ab laguma dhex hoyan doono, oo Carabkuna
halkaas teendho kama dhisan doono, oo adhijirraduna
halkaas adhigooda ma daajin doonaan. **21** Laakiinse
halkaas waxaa jiifsan doona dugaagga lamadegaanka,
oo guryahoodana waxaa ka buuxsami doona guumeyso,
oo waxaa ku hoyan doona gorayo, waxaana ku dhex
cayaari doona xayawaan dhogor dheer leh. **22** Oo yeey
baana guryahooda cidloobay qaylo isugu jawaabi doona, oo
daarahooda qurqurxoonna dawacooyin baa ka dhex qaylin
doona, oo wakhtigeediina kol dhow buu iman doonaa, oo
cimrigeedana lama sii dheerayn doono.

**14** Waayo, Rabbigu reer Yacquub wuu u naxariisan
doonaa, oo haddana reer binu Israa'iil ayuu dooran
doonaa, dalkoodiina wuu fadhiisin doonaa, oo waxaa iyaga
ku darman doona shisheeyayaal, wayna la degi doonaan
reerka Yacquub. **2** Oo dadyowga ayaa soo kaxayn doona, oo
waxay iyaga keeni doonaan meeshoodii, oo reer binu Israa'iil
ayaa iyaga dalka Rabbiga ugu haysan doona addoommo rag
iyo gabdho ah, oo maxaabiis ahaan bay u haysan doonaan
kuwii ay iyagu maxaabiista u ahaan jireen, oo waxay u talin
doonaan kuwii iyaga dulmi jiray. **3** Oo maalinta Rabbigu kaa
nasiyo murugtaadii, iyo dhibkaagii, iyo addoonsigii adkaa oo
lagugu addoonsanayay, **4** ayaad boqorka Baabuloon ku soo
maadsan doontaa, oo waxaad ka odhan doontaa, Kii wax
dulmi jiray sidee buu u dhammaaday! Magaalada gabbaro
qaadan jirtay sidee bay u idlaatay! **5** Rabbigu wuxuu jebiyey
hangoolkii kuwa sharka leh, iyo ushii taliyayaasha. **6** Kii
isagoo cadhaysan dadka ku dhufan jiray darbado joogta
ah, oo quruumaha u talin jiray isagoo xanaaqsan waa la
silciyaa iyadoo aan ciduna ka hor joogsan. **7** Dunida oo
dhammu way nasan tahay oo way xasilloon tahay, farxad
baana lala gabyayaa. **8** Dhirta berooshka ah iyo geedaha
kedarka ah ee Lubnaanba way kugu reyreeyaan, oo waxay
yidhaahdaan, Tan iyo waagii aad dhacday ninna nooma soo
kicin inuu na jarto. **9** She'oolka hoose wuu soo kacay oo
u dhaqdhaqaaqay inuu ku qaabbilo markaad timaado, oo
wuxuu kuu soo kiciyey kuwii dhintay oo ahaa xataa kuwii
dhulka ugu waaweynaa oo dhan, oo boqorradii quruumaha
oo dhan wuxuu ka soo kiciyey carshiyadoodii. **(Sheol h7585)**
**10** Oo iyana dhammaantood waxay kugu odhan doonaan,

War adiguna ma sidayadoo kalaad u taag gabtay? Oo ma
annagoo kalaad noqotay? 11 Sarrayntaadii iyo dhawaaqii
shareeradahaagaba waxaa hoos loogu soo dejiyey She'ool,
waxaa hoos lagaaga goglay dixiri, korkana waxaa lagaa
huwiyey dixiri. **(Sheol h7585)** 12 Xiddigta waaberiyow, Inanka
arooryadow, sidee baad samada uga soo dhacday! Kaagan
quruumaha taag yareeyeyow, sidee baa dhulka laguugu
riday! 13 Waxaad qalbigaaga iska tidhi, Anigu waxaan kori
doonaa samada, oo carshigaygana xiddigaha Ilaah waan ka
sara marin doonaa, oo weliba waxaan ku fadhiisan doonaa
buurta shirka ee darafka woqooyi ku taal. 14 Waxaan kori
doonaa daruuraha sare korkooda, oo waxaan noqon doonaa
sida Ilaaha ugu sarreeya oo kale. 15 Laakiinse waxaa
lagu dejin doonaa She'ool, iyo meelaha ugu hooseeya ee
yamayska. **(Sheol h7585)** 16 Oo kuwa ku arkaa way kugu
dhaygagi doonaan, wayna ku fiirsan doonaan, oo waxay
odhan doonaan, War kanu ma ninkii dhulka gariiriyey, oo
boqortooyooyinka ruxruxay, 17 oo dunida sidii lamadegaan
oo kale ka dhigay, oo magaalooyinkeedii dumiyey, oo aan
maxaabiistiisa u dayn inay gurigoodii ku noqdaan baa? 18
Boqorradii quruumaha oo dhammu dhammaantood sharaf
bay ku jiifaan iyagoo mid kastaaba qabrigiisa ku jiro. 19
Laakiinse adiga waa lagu xooray, oo qabrigaagii waa lagaa
fogeeyey sidii laan la karhay, oo sidii dharka kuwa la laayay
oo seefta lagu mudhbixiyey oo hoos ugu dhaca dhagaxyada
yamayska, ayaa sidii meyd oo kale lagugu tuntay. 20
Oo iyaga kuma darsami doontid, lagumana aasi doono,
maxaa yeelay, dalkaagii waad baabbi'isay, dadkaagiina waad
laysay. Farcanka xumaanfalayaasha weligood mar dambe
lama magacaabi doono. 21 Meel lagu laayo u diyaarsha
carruurtiisa xumaantii aabbayaashood aawadeed, si ayan
u sara kicin, oo ayan dhulka u hantiyin, oo ayan dunida
korkeedana magaalooyin uga buuxin. 22 Rabbiga ah Ilaaha
ciidammadu wuxuu leeyahay, Anigaa ku soo kici doona
iyaga, oo Baabuloon ayaan ka baabbi'in doonaa magac iyo
dad hadhay, iyo wiil iyo wiil wiilkii. 23 Oo weliba Rabbiga
ciidammadu wuxuu leeyahay, Waxaan ka dhigi doonaa
hantida caanaqubta iyo balliyo biyo ah, oo waxaan ku
xaaqi doonaa xaaqinka baabbi'inta. 24 Rabbiga ciidammadu
wuxuu ku dhaartay oo yidhi, Sida xaqiiqada ah waxay noqon
doontaa sidii aan ku fikiray, oo taladanuna waxay u hagaagi
doontaa sidii aan u qasdiyey, 25 taasoo ah inaan kan reer
Ashuur dalkayga ku jebin doono, buurahayga korkoodana
isaga ku tuman doono, markaasaa harqoodkiisu iyaga ka
fogaan doonaa, culayskiisuna garbahooda ka degi doonaa.
26 Kanu waa qasdigii loola qasdiyey dhulka oo dhan, oo
tanuna waa gacantii lagu kor fidiyey quruumaha oo dhan.
27 Waayo, Rabbiga ciidammadu waxan wuu u qasdiyey,
haddaba bal yaa burin doona? Oo gacantiisiina way soo
fidsan tahay, yaa dib u celin doona? 28 Sannaddii Boqor
Aaxaas dhintay ayaa warkan culus la yidhi. 29 Reer Falastiin
oo dhammow, ha ku farxin in ushii lagugu garaacay jabtay,
maxaa yeelay, abeesada xididkeeda waxaa ka soo bixi doona
jilbis, oo farcankiisuna wuxuu noqon doonaa masduulaa dab
leh. 30 Oo curadka masaakiinta ayaa wax cuni doona, kuwa
baahanna ammaan bay ku jiifsan doonaan, oo xididkaagana
waxaan ku dili doonaa abaar, kuwa kaa hadhayna waa la
layn doonaa. 31 Iriddow, barooro. Magaaladaay, ooy! Reer
Falastiin oo dhammow, kulligaa cabsi la dhalaal, waayo,
waxaa woqooyi ka iman doona qiiq, oo midna saaxiibbadiis
kama hadhi doono. 32 Haddaba bal maxaa loogu jawaabi
doonaa wargeeyayaasha quruunta? Waxaa loogu jawaabi
doonaa in Rabbigu Siyoon aasaasay oo kuwa dhibaataysan
ee dadkiisuna ay dhexdeeda magangeli doonaan.

**15** Kanu waa warka culus ee Moo'aab ku saabsan.
Caartii Moo'aab habeen qudha baa lagu dumiyey
oo baabba'shay; Qiirtii Moo'aab habeen qudha baa lagu
dumiyey oo baabba'shay. 2 Waxaa kor loogu baxay Bayid iyo
Diboon oo meelaha sare ku yaal in lagu ooyo, reer Moo'aab
waxay u baroortaan Neboo iyo Meedebaa, madaxyadooda
oo dhan waa la xiiray oo gadh kastana waa la jaray. 3
Jidadkooda waxaa lagu guntadaa dhar joonyad ah, oo
guryahooda dushooda iyo jidadkooda ayaa mid kastaaba
ka baroortaa isagoo aad u ooyaya. 4 Oo Xeshboon iyo
Elecaaleehba way qayliyaan, oo codkoodana waxaa laga
maqlaa tan iyo Yahas, sidaas daraaddeed ragga hubka
leh ee Moo'aab aad bay u qayliyaan, oo cabsi bay la
gariiraan. 5 Qalbigaygu wuxuu u ooyaa reer Moo'aab,
kuwoodii qaxay waxay u cararaan tan iyo Socar iyo ilaa
Ceglad Shelishiyaah, waayo, oohin bay la fuulaan jiirta
Luxiid, oo jidka Xororayimna waxay kor ugu qaadaan qaylo
baabba'eed. 6 Waayo, biyaha Nimriim baabba' bay noqon
doonaan, cawskiina wuu engegay, biqilkiina wuu qallalay, oo
wax cagaar ahna innaba lama arko. 7 Sidaas daraaddeed
maalkii badnaa ee ay urursadeen iyo wixii ay kaydsadeenba
waxay u qaadan doonaan durdurka geedaha safsaafka ah.
8 Waayo, qayladii waxay gaadhay soohdimaha Moo'aab ku
wareegsan, baroortoodii waxay gaadhay tan iyo Eglayim, oo
baroortoodiina waxay gaadhay tan iyo Bi'ir Eelim. 9 Biyaha
Diimoon dhiig baa ka buuxa, weliba waxaan Diimoon ku
keeni doonaa belaayo kale, kan Moo'aab ka baxsaday iyo
kuwa dalka ku hadhayba libaax baan ku diri doonaa.

**16** Taliyaha dalka baraarka uga soo dira Selac oo cidlada
ag taal, oo waxaad ugu keentaan buurta magaalada
Siyoon. 2 Waayo, sidii shimbir wareegaysa oo buulkeedii laga
tuuray ayaa gabdhaha Moo'aab ku ahaan doonaan meelaha
Webi Arnoon laga gudbo. 3 Talo ku tali, oo caddaalad ku
garsoor, maalin hadh cad ah hooskaaga ka dhig habeen
madow oo kale, masaafurisyada qari, oo magantana ha
gacangelin. 4 Kuwa Moo'aab ee masaafurisyada ah ha
kula joogeen, oo waxaad gabbaad uga noqotaa kan iyaga
dhacaya, waayo, kii wax dulmi jiray wuu dhammaaday,
dhiciddiina way joogsatay, kuwii dadka cadaadin jirayna
dalkaa laga baabbi'iyey. 5 Oo carshigu naxariis buu ku
dhismi doonaa, oo run ahaan waxaa carshiga taambuugga
Daa'uud dhexdiisa ah ku fadhiisan doona mid caddaalad
ku garsoora, caddaaladna doondoona, oo xaqnimada ku
dhaqsada. 6 Waxaannu maqalnay kibirkii Moo'aab oo uu
aad u kibray, iyo xataa madaxweynaantiisa, iyo kibirkiisa, iyo
cadhadiisa, faankiisuna waa wax aan waxba tarayn. 7 Sidaas
daraaddeed reer Moo'aab waxay u ooyi doonaan dalka
Moo'aab, oo mid kastaaba waa ooyi doonaa. Oo waxaad
aad ugu barooran doontaan aasaaska Qiir Xaresed oo aad
wax loogu dhuftay. 8 Waayo, beerihii Xeshboon way qallalan
yihiin, quruumaha madaxdoodii ayaa jejebisay geedihii
canabka ee Sibmaah oo soo gaadhay xataa tan iyo Yacser
oo xagga cidlada u soo baxay. Laamihiisii way fidsanaayeen
oo badday dhaafeen. 9 Sidaas daraaddeed waxaan canabka
Sibmaah ugu ooyi doonaa oohintii aan Yacser ugu ooyay oo
kale. Xeshboon iyo Elecaaleehow, waxaan idinku waraabin
doonaa ilmadayda, waayo, midhahaagii la hor guray iyo
beergoosadkaagiiba waxaa ku dhacday qayladii dagaalka.
10 Farxaddii waa la qaaday, oo beertii midhaha badnaydna
farxaddii waa laga bixiyey, oo beeraha canabka ahna hees
iyo rayrayn ma jiri doonaan, mana jiri doono mid canabka
macsarooyin ku tunta, oo qaylada tumidda canabkana waan
joojiyey. 11 Haddaba sidaas daraaddeed qalbigaygu wuxuu
sida kiraar oo kale ugu barooranayaa Moo'aab aawadeed,
oo calooshayduna Qiir Xaresed aawadeed. 12 Oo markii
Moo'aab iskeeno oo uu meesha sare ku daalo, oo uu
meeshiisa quduuska ah u yimaado si uu ugu tukado, innaba
ma guulaysan doono. 13 Kanu waa eraygii uu Rabbigu waagii
hore reer Moo'aab kaga hadlay. 14 Laakiinse haatan Rabbigu
wuu hadlay oo wuxuu yidhi, Muddo saddex sannadood ah
sida shaqaale sannaddiis ayaa sharafta reer Moo'aab lagu
quudhsan doonaa, isaga iyo dadkiisa faraha badan, oo kuwa
hadhi doonaana waxay ahaan doonaan in yar oo aan tabar
lahayn.

**17** Kanu waa warka culus ee Dimishaq ku saabsan.
Bal eega, Dimishaq inay magaalo sii ahaato waa
laga joojiyey, oo waxay ahaan doontaa tuulmooyin burbur
ah. 2 Magaalooyinkii Caroceer waa laga wada tegey.
Waxay noqon doonaan meelo adhyuhu daaqaan oo ay
iska fadhiistaan, oo ciduna ma didin doonto. 3 Rabbiga
ciidammadu wuxuu leeyahay, Qalcaddu reer Efrayim way
ka baabbi'i doontaa, oo boqortooyaduna Dimishaq way ka
dhammaan doontaa, oo kuwa Suuriya ka hadhi doonaana
waxay noqon doonaan sida sharaftii dadkii Israa'iil. 4 Oo
maalintaas sharafta reer Yacquub way daciifi doontaa, oo
baruurta jidhkiisuna way macaluuli doontaa. 5 Oo waxay
noqon doontaa sida marka beeragooyuhu balka soo urursho
oo gacantiisuna ay sabuullada soo gurato, oo waxay noqon
doontaa sida mid sabuullo laga tegey ka guranaya dooxada
Refaa'iim. 6 Rabbiga ah Ilaaha reer binu Israa'iil wuxuu
leeyahay, Weli canab xaabxaab ah ayaa ku hadhi doona, oo
sida geed saytuun ah oo la ruxay ayaa laba ama saddex
xabbadood ku hadhi doonaan laanta geedka ugu korraysa
dhaladeeda, laamaha ugu shisheeya oo midhaha badanna
waxaa ku hadhi doona afar ama shan xabbadood. 7 Oo
maalintaas nin baa wuxuu fiirin doonaa Abuurihiisii, oo
indhihiisuna waxay u jeedsan doonaan Kan Quduuska ah oo
reer binu Israa'iil. 8 Oo isagu ma uu fiirin doono meelaha
allabariga ee uu gacmihiisa ku sameeyey, umana uu jeedsan
doono wixii ay farihiisu sameeyeen, kuwaasoo ah geedaha
Asheeraah, iyo sanamyada qorraxda. 9 Oo maalintaas
magaalooyinkiisa xoogga badanu waxay noqon doonaan
sida meelaha ay reer Xiwi iyo reer Amor kaga tageen reer
binu Israa'iil hortood, oo waxaa jiri doona baabba'. 10 Maxaa
yeelay, waxaad illowday Ilaaha badbaadadaada, oo kamana
aad fikirin Dhagaxa xoogga kuu ah, sidaas daraaddeed
waxaad beertaa geedo wacan, waxaadna tallaashaa geedo
qalaad oo canab ah. 11 Maalintii aad beerto ayaad xeraysaa,
subaxdiina waxaad ubax ka keentaa abuurkaaga, laakiinse
beergoosadku wuxuu carari doonaa maalin murug iyo
caloolxumo badan. 12 Dadka faraha badanu aad bay u
buuqayaan, oo waxay u hugmaan sida hugunka badda!
Quruumuhu aad bay u bulxamayaan, oo waxay u guuxaan
sidii guuxa biyo xoog badan! 13 Quruumuhu waxay u
guuxi doonaan sida guuxa biyo faro badan, laakiinse wuu
canaanan doonaa, oo meel fog bay u carari doonaan, oo
waxaa loo eryi doonaa sida xaabka buuraha ee dabayshu
kaxayso iyo sida boodh cirwareen ah. 14 Bal eega, makhribkii
cabsi baa jirta, oo aroortii ka horna ma jiraan. Taasu waa
waxa ku dhaca kuwa na booba iyo qaybtii kuwa na dhaca.

**18** Dalka baalasha hadhsanaya wuxuu ka sii shisheeyaa
webiyaasha Kuush! 2 Ergooyin ayuu badda ku diraa,
oo xataa doonniyo caw ah ayuu biyaha korkooda ku diraa
oo yidhaahdaa, Wargeeyayaasha dheereeyow, waxaad
u tagtaan quruun dheer oo sulubsan, oo ah dad tan iyo
bilowgoodii aad looga cabsado, oo ah quruun xoog badan
oo wax ku tumata, oo dalkeeda webiyadu kala qaybiyaan! 3
Kuwiinna dunida deggan oo dhammow, kuwiinna dhulka
joogow, markii buuraha korkooda calan laga taago fiiriya,
oo markii buunka la yeedhiyana maqla. 4 Waayo, Rabbigu
wuxuu igu yidhi, Anigoo aamusan, ayaan hoygayga wax ka
soo fiirin doonaa sida kulaylka widhwidhaya ee qorraxda, iyo
sida daruur darab ah oo xilliga beergoosadka hooraysa. 5
Waayo, beergoosadka ka hor markuu ubaxu dhammaado,
oo uu ubaxu canab bislaanaya noqdo ayuu manjo laamaha
yaryar ku gooyn doonaa, oo laamaha waaweyn ee sii
faafayana wuu gooyn doonaa oo fogayn doonaa. 6 Oo iyaga
waxaa dhammaantood looga wada tegi doonaa haadka
buuraha iyo dugaagga dhulka, oo haadka ayaa iyaga kulaylka
ka hadhsan doonaa, oo dugaagga dhulka oo dhammuna
iyagay qabowga ka dugsan doonaan. 7 Oo wakhtigaas
waxaa Rabbiga ciidammada loo keeni doonaa hadiyad
laga keenay dadka dheer oo sulubsan oo ah dad tan iyo
bilowgoodii aad looga cabsado, oo ah quruun xoog badan
oo wax ku tumata, oo dalkeeda webiyadu kala qaybiyaan, oo
waxaa la keeni doonaa Buur Siyoon oo ah meesha magaca
Rabbiga ciidammada.

**19** Kanu waa warka culus ee Masar ku saabsan. Bal eega,
Rabbigu wuxuu fuushan yahay daruur dheeraysa oo
wuxuu u socdaa Masar, oo sanamyada Masarna waxay
ku gariiri doonaan hortiisa, oo Masriyiinta qalbigooduna
cabsi buu kula dhex dhalaali doonaa. 2 Oo Masriyiinta
waxaan ku kicin doonaa Masriyiin kale, oo midkood kastaaba
wuxuu la diriri doonaa walaalkiis iyo deriskiisa, magaalaba
magaalay la diriri doontaa, boqortooyana boqortooyo kale.
3 Oo Masriyiinta ruuxooduna wuu ka dhammaan doonaa,
oo taladooda waan baabbi'in doonaa, oo waxay talo u
doonan doonaan sanamyada, iyo falanfallowyada, iyo kuwa
ruuxaanta leh, iyo saaxiriinta. 4 Oo Sayidka ah Rabbiga
ciidammadu wuxuu leeyahay, Anigu waxaan Masriyiinta
gacanta u gelin doonaa sayid nac weyn, oo waxaa u talin
doona boqor xoog badan. 5 Oo biyuhuna badda way ka
madhan doonaan, oo webiguna wuu gudhi doonaa oo
engegi doonaa. 6 Oo webiyaashuna way qudhmi doonaan
oo durdurrada Masarna way madhan doonaan oo engegi
doonaan, oo cawsduurka iyo dareemaduna way wada qallali
doonaan. 7 Oo seeraha Webi Niil oo qarkiisa ku yaal, iyo wax
kasta oo lagu beeray Webi Niil agtiisuba way wada engegi
doonaan, oo dabayshaa la tegi doonta, oo mar dambena
lama arki doono. 8 Oo kalluumaystayaashuna way ooyi
doonaan, kuwa jillaabka Webi Niil ku rida oo dhammuna
way wada barooran doonaan, oo kuwa biyaha korkooda
shabagga ku kala bixiyaana way macaluuli doonaan. 9 Oo
kuwa geed linenka dharka ka sameeya iyo kuwa cudbiga
dharka ka sameeyaaba way quusan doonaan. 10 Oo
kuwa waddanka tiirarka u ah oo dhammuna way wada
jabi doonaan, kuwa kiro u shaqeeyaana way murugoon
doonaan. 11 Amiirrada Socan waa nacasyo, oo taladii
taliyayaasha ugu xigmad badnaa ee Fircoon waxay noqotay
doqonnimo. Sidee baad Fircoon ugu tidhaahdaan, Anigu
waxaan ahay nin xigmad leh wiilkiis, oo waxaan ahay
farcankii boqorradii hore? 12 Haddaba meeye raggaaga
xigmadda lahu? Oo bal haatan ha kuu sheegeen, oo ha
ogaadeen waxa Rabbiga ciidammadu Masar ugu talaggalay.
13 Amiirradii Socan waxay noqdeen nacasyo, oo amiirradii
Nofna waa la khiyaaneeyey Masarna waxaa qalday kuwa
qabiilooyinkeeda tiirarka u ah. 14 Oo Rabbigu wuxuu ku
dhex qasay wareer, oo iyana waxay Masar shuqulladeedii
oo dhan ugu qaldeen sida nin sakhraanu mantaggiisa ugu
dhacdhaco oo kale. 15 Oo Masarna laguma arki doono
shuqul ay samayn karaan madaxa ama dabadu, laanta
ama cawsduurku toona. 16 Oo wakhtigaas Masriyiintu
waxay noqon doonaan sida naago oo kale, oo waxay la
gariiri doonaan oo la cabsan doonaan ruxruxidda gacanta
Rabbiga ciidammada, oo uu Masar korkeeda ku ruxruxi
doono. 17 Oo dalka Yahuudahna cabsi buu Masar u noqon
doonaa, oo mid kasta oo la xusuusiyaaba wuu ka cabsan
doonaa, waana talada Rabbiga ciidammadu uu iyaga u
goostay aawadeed. 18 Oo wakhtigaas waxaa dalka Masar
jiri doona shan magaalo oo afka Kancaan ku hadasha oo
Rabbiga ciidammada ku dhaarata, oo middoodna waxaa lagu
magacaabi doonaa Magaalada baabba'a. 19 Oo wakhtigaas
dalka Masar dhexdiisa meel allabari baa Rabbiga ugu oolli
doonta, oo soohdinteedana waxaa Rabbiga u jiri doona tiir.
20 Oo taasu waxay calaamad iyo markhaati dalka Masar
dhexdiisa ugu noqon doontaa Rabbiga ciidammada, waayo,
kuwa dulma aawadood ayay Rabbiga ugu qayshan doonaan,
oo isna wuxuu u soo diri doonaa badbaadiye iyo mid xoog
badan, wuuna samatabbixin doonaa. 21 Oo wakhtigaas ayaa
Rabbigu Masriyiinta is-ogeysiin doonaa, oo ay Masriyiintuna
Rabbiga aqoon doonaan, oo waxay ku caabudi doonaan
allabari iyo qurbaan, oo Rabbiga ayay nidar u nidri doonaan,
wayna oofin doonaan. 22 Oo Rabbigu wax buu Masar ku

dhufan doonaa, wax buu ku dhufan doonaa, wuuna dawayn
doonaa, oo iyana Rabbigay u soo noqon doonaan, oo isna
baryootankooda ayuu aqbali doonaa, wuuna bogsiin doonaa.
**23** Oo wakhtigaas waxaa jiri doona jid weyn oo Masar ka
baxa oo tan iyo Ashuur gaadha, oo kuwa reer Ashuur
ah ayaa Masar geli doona, oo Masriyiintuna reer Ashuur
bay Ilaah la caabudi doonaan. **24** Oo wakhtigaas dalka
Israa'iil wuxuu saddex ku noqon doonaa Masar iyo Ashuur,
oo dhulka dhexdiisana barako buu ku ahaan doonaa, **25**
waayo, Rabbiga ciidammadu wuu barakeeyey, isagoo leh,
Barako waxaa leh Masar oo ah dadkayga, iyo Ashuur oo ah
shuqulkii gacmahayga, iyo Israa'iil oo ah dhaxalkayga.

**20** Sannaddii Sargoon oo ahaa boqorkii Ashuur uu Tartaan
Ashdood u diray, oo uu tegey, oo la diriray oo qabsaday
Ashdood, **2** ayaa Rabbigu Ishacyaah ina Aamoos la hadlay
oo wuxuu ku yidhi, Tag, oo dharka joonyadda ah dhexdaada
ka fur, oo kabahaagana iska siib. Oo isna saasuu yeelay, oo
wuxuu socday isagoo qaawan oo caga cad. **3** Markaasaa
Rabbigu wuxuu yidhi, Sidii addoonkaygii Ishacyaah saddex
sannadood qaawanaan iyo cago caddaan uu ugu socday
inuu calaamad iyo yaab Masar iyo Itoobiyaba u ahaado
**4** ayaa boqorka Ashuur kaxaysan doonaa maxaabiista
Masar iyo masaafurisyada Itoobiya, yar iyo weynba, iyagoo
qaaqaawan oo wada cagacad, oo badhidoodu muuqato, si
uu Masriyiinta u ceebeeyo aawadeed. **5** Markaasaa la nixi
doonaa oo la ceeboobi doonaa Itoobiya oo rajadoodii ahayd
aawadeed iyo Masar oo sharaftoodii ahayd aawadeed. **6** Oo
kuwa xeebta degganu waxay wakhtigaas odhan doonaan,
Bal eega wixii ku dhacay kuwii aan isku hallaynaynay
oo aan caawimaad ugu cararaynay inay boqorka Ashuur
naga samatabbixiyaan Oo bal annagu sidee baannu u
baxsanaynaa?

**21** Kanu waa warka culus ee ku saabsan cidlada badda ku
ag taal. Sida cirwareentu koonfur uga timaado oo kale
ayuu cidlada oo ah dal cabsi badan uga yimaadaa. **2** Waxaa
lay tusay muujin culus. Khaa'inkii khiyaanuu sameeyaa, oo
kan wax dhacaana wax buu dhacaa. Reer Ceelaamow, ku
kac, reer Maadayow, hareeree. Taahiddii oo dhan anigu
waan joojiyey. **3** Sidaas daraaddeed naxdin baa cidhiidhi i
gelisay, oo waxaa i qabtay xanuun badan sida naag foosheed
oo kale, oo xanuun aawadiis waxba waan maqli kari waayay,
oo naxdin aawadeed waxba waan arki kari waayay. **4** Waan
qalbitakhtakhay, oo cabsi baa i argaggixisay. Fiidkii aan
istareexa ka filanayay gariir buu iigu rogmaday. **5** Miis bay
diyaarsadaan, oo gogol bay gogladaan, wax bayna cunaan
oo cabbaan. Amiirradow, sara joogsada, oo gaashaanka
subka. **6** Waayo, Sayidku wuxuu igu yidhi, Tag, oo waardiye
meel dhig, oo isna wuxuu arko ha sheego. **7** Oo markaasuu
arkay ciidan fardo fuushan oo laba laba u socda, iyo ciidan
dameerro fuushan, iyo ciidan rakuubbo fuushan, aad buuna
u dhegaystay oo aad iyo aad buu uga fikiray. **8** Oo wuxuu u
qayliyey sidii libaax oo kale oo yidhi, Sayidow, maalintii oo
dhan waxaan had iyo goorba ku kor taagnahay munaaradda
waardiyaha, oo habeen walbana waxaan joogaa meeshayda
waardiyaha. **9** Oo bal eeg, waxaa soo socda ciidan fardo
fuushan oo laba laba u socda. Oo isna waa u jawaabay
oo wuxuu yidhi, Baabuloon waa dhacday, waa dhacday,
oo sanamyadeedii xardhanaa oo ilaahyadeedu way wada
jajabeen oo dhulkay daadsan yihiin. **10** Dadkayga sida
hadhuudh la tumayow, wixii aan Rabbiga ciidammada oo ah
Ilaaha reer binu Israa'iil ka maqlay waan idin ogeysiiyey. **11**
Kanu waa warka culus ee Duumah ku saabsan. Mid baa
aniga Seciir iiga yeedhay, isagoo leh, Waardiyow, habeenka
ka warran? **12** Oo waardiyihiina wuxuu yidhi, Waagu waa
beryayaa, habeenkuna waa soo socdaa, haddii aad wax
weyddiinaysaan, weyddiiya, soo noqda oo kaalaya. **13** Kanu
waa warka culus ee dalka Carabta ku saabsan. Kuwiinna
safarka ah oo reer Dedaanow, waxaad ku hoyan doontaan
kaynta dalka Carabta. **14** Kuwa oomman biyo u keena,
kuwa dalka Teemaa degganow, kuwa qaxay cunto kala hor
taga. **15** Waayo, iyagu seef bay ka carareen, taas oo ahayd
seef gal la', iyo qaanso xodan iyo dagaal aad u kulul. **16**
Waayo, Sayidku wuxuu igu yidhi, Muddo sannad ah oo
ah sida sannadaha shaqaalaha ayaa sharafta Qedaar oo
dhammu ku baabbi'i doontaa. **17** Oo intii ka hadhay tirada
ragga qaansaleyda ah oo ah ragga xoogga badan oo reer
Qedaarna way yaraan doontaa, waayo, Rabbiga ah Ilaaha
reer binu Israa'iil ayaa saas ku hadlay.

**22** Kanu waa war culus ee dooxada muujinta ku saabsan.
War maxaa idinku dhacay, oo aad dhammaantiin
guryaha dushooda la korteen? **2** Magaalada qaylada iyo
bulxanku ka buuxaanay, magaalada farxadda badanay, kuwa
dhexdaada lagu laayay seef laguma layn, dagaalna kuma ay
dhiman. **3** Taliyayaashaadii oo dhammu way wada carareen,
oo qaansola'aan iyagoo ah ayaa la xidhay. Inta lagaa helay oo
dhan waa la wada xidhay in kastoo ay meel fog u carareen.
**4** Sidaas daraaddeed ayaan idhi, Aniga iga sii jeesta. Si
qadhaadh baan u ooyi doonaa, ha isku daalinnina inaad
dadkayga iiga qalbi qabowjisaan. **5** Waayo, waa maalin ay
naxdin iyo kutumasho iyo isku qasnaanu Sayidka ah Rabbiga
ciidammada ka iman doonaan oo ay dooxada muujinta ku
dhici doonaan, waana wakhti derbiyada la dumin doono oo

buuraha lagu qaylin doono. **6** Oo reer Ceelaam wuxuu qaatay
gabooyihii, oo gaadhifardoodyo iyo rag fardo fuushan baa la
socday, oo reer Qiirna gaashaankii buu daaha ka qaaday.
**7** Oo waxay noqotay in dooxooyinkaagii ugu wacanaa
gaadhifardoodyo ka buuxsameen, ragga fardooleyda ahuna
waxay isku diyaariyeen iridda horteeda. **8** Oo isna wuxuu
banneeyey daahii dadka Yahuudah, oo adna maalintaas
waxaad aad u fiirisay hubkii guriga kaynta yiil. **9** Oo weliba
waxaad aragteen in daldaloolka magaalada Daa'uud ay
badan yihiin, oo waxaad isku soo wada ururiseen biyihii
balliga hoose. **10** Oo waxaad tiriseen guryihii Yeruusaalem,
oo waxaad guryihii u dumiseen inaad derbiga adkaysaan.
**11** Oo weliba biyihii balligii hore waxaad biyoxidheen uga
samayseen labada derbi dhexdooda laakiinse ma aydaan
fiirin kii waxan sameeyey, mana aydaan u jeedsan kii waa
hore sameeyey. **12** Oo Sayidka ah Rabbiga ciidammadu
wuxuu maalintaas dadka ugu yeedhay oohin, iyo madax-
xiirnaan, iyo dhar joonyad ah guntashadiisa. **13** Oo bal
eega, waxaa jira farxad iyo rayrayn, dibi la qalo iyo ido la
gowraco, hilib la cuno iyo khamri la cabbo, oo waxaa la
yidhaahdaa, Aynu wax cunno oo cabno, waayo, berrito waynu
dhiman doonaaye. **14** Oo Rabbiga ciidammada ayaa waxan
dhegaha ii saaray. Sida xaqiiqada ah xumaantan laydinkama
maydhi doono jeeraad dhimataan, ayaa Sayidka ah Rabbiga
ciidammadu leeyahay. **15** Sayidka ah Rabbiga ciidammadu
wuxuu leeyahay, Kac, oo waxaad u tagtaa Shebnaa oo ah
khasnajiga guriga u sarreeya, oo waxaad ku tidhaahdaa, **16**
Waadiga qabrigaagii halkan ka qotay, oo xabaashaadiina
meel sare ka qotay, oo dhagaxana hoy ka samaystay,
bal maxaad halkan ku samaynaysaa? Oo yaad halkan ku
haysataa? **17** Bal eeg, ninka xoogga badanow, Rabbigu xoog
buu kuu tuuri doonaa. Aad buu kuu qaban doonaa. **18** Oo
hubaal sida kubbad oo kale ayuu kugu wadhfin doonaa dhul
weyn oo ballaadhan, oo halkaasaad ku dhiman doontaa, oo
gaadhifardoodyadii sharaftaaduna halkaasay joogi doonaan,
adigoo ah ceebta gurigii sayidkaaga. **19** Oo waxaan kaa eryi
doonaa derejadaada, oo jagada aad joogtona isagaa kaa
soo dejin doona. **20** Oo waxaan maalintaas u yeedhi doonaa
addoonkayga Elyaaqiim ina Xilqiyaah. **21** Oo waxaan isaga
huwin doonaa shuluggaaga, oo waxaan ku adkayn doonaa
dhex-xidhkaaga, oo dowladnimadaada isagaan u dhiibi
doonaa, oo isna aabbe buu dadka Yeruusaalem deggan
iyo reer Yahuudah u noqon doonaa. **22** Oo furihii guriga
Daa'uudna garbihiisaan saari doonaa, oo wuu furi doonaa,
oo ninna ma xidhi doono, wuu xidhi doonaa, oo ninna ma furi
doono. **23** Oo waxaan isaga u dhuujin doonaa sida dhidib
meel adag haysta, oo isna wuxuu reerka aabbihiis u noqon
doonaa carshi sharaf badan. **24** Oo waxaa korkiisa laga
lalmin doonaa sharaftii reerka aabbiihiis oo dhan, dhasha
iyo farcanka, iyo weelasha yaryar oo dhan, koobabka iyo
xataa sibraarrada waaweyn oo dhanba. **25** Oo Rabbiga
ciidammadu wuxuu leeyahay, Maalintaas dhidibkii meesha
adag ku dhuuqsanaa wuu ka siibmi doonaa, oo intuu jabo
ayuu dhici doonaa, oo culayskii saarnaana waa la baabbi'in
doonaa, waayo, Rabbiga ayaa saas ku hadlay.

**23** Kanu waa warka culus ee Turos ku saabsan.
Doonniyaha Tarshiishow, baroorta, waayo, way
baabba'day, guri iyo irid la galo midna ma leh, waxaana iyaga
looga muujiyey dalka Kitiim. **2** Kuwiinnan gasiiradda deggan
ee baayacmushtariyaasha Siidoon oo badda gudbayaa ay
alaab ka buuxiyeenow, aamusa. **3** Biyaha badan waxaa laga
keenay sarreenkii Shiixoor iyo waxa beerihii Webi Niil laga
goostay oo faa'iidadeedii ahaa, oo iyadu waxay noqotay
suuqii quruumaha. **4** Siidoonay, ceebow, waayo, baddii way
hadashay, oo qalcaddii baddu waxay tidhi, Anigu ma foolan,
carruurna ma dhalin, barbaarrona ma korin, gabdhona ma
korin. **5** Markii warku Masar soo gaadho aad bay warka
Turos uga xanuunsan doonaan. **6** Tarshiish xaggeeda u
gudba. Kuwiinna gasiiradda degganow, baroorta. **7** Tanu
ma magaaladiinnii waa hore jirtay oo faraxsanayd baa oo
cagaheeda meel fog u waday inay dal shisheeye degto
aawadeed? **8** Yaa taladan u goostay Turos oo ahayd
magaaladii taajajka bixisay, oo baayacmushtariyaasheedu
amiirro ahaayeen, oo geddisleydeeduna ay ahaayeen kuwii
dhulka sharafta ku lahaa? **9** Rabbiga ciidammada ayaa
waxaas u qasdiyey inuu jebiyo kibirka faanka oo dhan, iyo
inuu ka dhigo in kuwa dhulka sharafta ku leh oo dhan la
quudhsado. **10** Reer Tarshiishow, bal dalkaaga dhex mar sida
Webi Niil oo kale. Innaba wax ku celiya oo dambe ma jiraan.
**11** Isagu wuxuu gacantiisa ku fidiyey badda korkeeda, oo
boqortooyooyinkiina wuu gariiriyey. Rabbigu wuxuu amar ku
bixiyey in la dumiyo qalcadaha Kancaan. **12** Oo isagu wuxuu
yidhi, Dadka Siidoon oo ah sida bikrad la nijaaseeyeyow,
mar dambe ma farxi doontid. Kac, oo xagga Kitiim u gudub,
oo xataa halkaasna nasasho kama heli doontid. **13** Bal dalka
reer Kaldayiin fiiriya, dadkaasu ma jirin. Kii reer Ashuur
kuwii cidlada degganaa ayuu u aasaasay, munaaradaa
la dhisay, daaraheedii waaweynaana waa la dumiyey,
oo baabba' buu ka dhigay. **14** Doonniyaha Tarshiishow,
baroorta, waayo, qalcaddiinnii waa la baabbi'iyey. **15** Oo
waxay wakhtigaas noqon doontaa in Turos la illoobi doono
toddobaatan sannadood, oo ah sida boqor wakhtigiis. Oo
toddobaatankaas sannadood markay dhammaadaan ayaa

Turos waxaa laga heesi doonaa sida dhillada oo kale. 16
Dhilladii la illoobayay, kataarad qaado, oo magaalada ku
dhex wareeg, oo luuq macaan luuqee, oo heeso badan hees,
si lagugu soo xusuusto aawadeed. 17 Oo toddobaatanka
sannadood markay dhammaadaan ayaa Rabbigu Turos soo
booqan doonaa, oo waxay ku soo noqon doontaa kiradeedii,
oo waxay dhulka kaga dhillaysan doontaa boqortooyooyinka
dunida oo dhan. 18 Laakiinse baayacmushtarigeeda iyo
kiradeedaba quduus baa Rabbiga looga dhigi doonaa,
lama urursan doono, lamana kaydsan doono, waayo,
baayacmushtarigeedu wuxuu u ahaan doonaa kuwa Rabbiga
hortiisa jooga inay wax ku filan cunaan oo ay dhar raagaya
xidhaan.

**24** Bal eega, Rabbigu dalkuu madhinayaa, oo baabba'
buu ka dhigayaa, wuuna afgembiyayaa, oo kuwa
degganna wuu kala firdhinayaa. 2 Oo waxay noqon doontaa
in wixii dadka ku dhaca ay wadaadkana ku dhacaan, oo
wixii addoonka hela, sayidkana way heli doonaan, oo wixii
iibiyaha helana, iibsadahana way heli doonaan, oo wixii
amaahiyaha helana amaahsadahana way heli doonaan, oo
wixii korsaarqaataha helana, korsaarbixiyahana way heli
doonaan. 3 Oo dalkana dhammaantiis waa la madhin doonaa
oo la kharribi doonaa, waayo, Rabbiga ayaa eraygaas ku
hadlay. 4 Dhulku wuu baroortaa, wuuna qallalaa, dunidu way
daashaa, wayna qallashaa, oo dadka sarena way daalaan.
5 Oo dhulkiina waxaa nijaaseeyey kuwa deggan, maxaa
yeelay, iyagu qaynuunnadii bay ku xadgudbeen, oo amarkiina
way beddeleen, oo axdigii daa'imka ahaana way jebiyeen.
6 Sidaas daraaddeed dhulkii waxaa baabbi'iyey habaar,
oo kuwii dhex degganaana eed baa laga helay, sidaas
daraaddeed kuwii dhulka degganaa way gubteen oo wax yar
baa ka hadhay. 7 Khamriga cusubu wuu baroortaa, dhirta
canabkuna way dhadaa, oo kuwii qalbigoodu faraxsanaa oo
dhammuna way taahaan. 8 Farxaddii dafku way joogsatay, oo
kuwii rayraynayay buuqoodiina waa dhammaaday, farxaddii
kataaradduna way joogsatay. 9 Mar dambe khamri hees
kuma ay cabbi doonaan, oo wax lagu sakhraamona wuu u
qadhaadhaan doonaa kuwa cabba. 10 Magaalada cidlada ah
waa la dumiyey, oo guri kastana waa la xidhay si aan ninna u
soo gelin. 11 Jidadka waxaa looga ooyayaa khamri la waayay
aawadeed, farxaddii oo dhammuna way madoobaatay, oo
rayrayntiina dalkay ka dhammaatay. 12 Magaaladii waxaa
lagaga dhex tegey baabba', oo albaabkiina intii la jebiyey,
ayaa la baabbi'iyey. 13 Waayo, sidaasay ahaan doontaa dalka
iyo dadyowga dhexdoodaba, oo waxay noqon doontaa sida
ruxruxidda geedka saytuunka ah iyo sida xaaxaabka canabka
marka midhaha laga gurto dabadeed. 14 Codkooday kor u
qaadi doonaan, wayna dhawaaqi doonaan, oo haybadda
Rabbiga ayay badda aad ugaga qaylin doonaan. 15 Haddaba
sidaas daraaddeed xagga bari Rabbiga ka ammaana, oo
Rabbiga ah Ilaaha reer binu Israa'iil magiciisana waxaad ka
ammaantaan gasiiradaha badda. 16 Darafka dhulka ugu
shisheeya ayaan ka maqalnay gabayo lahaa, Ammaanu
ha u ahaato kan xaqa ah. Laakiinse anigu waxaan idhi,
Caatoobay oo caatoobay, anaa iska hoogay! Khaa'innadii
khiyaanay sameeyeen, hubaal khaa'innadii aad iyo aad
bay khiyaano xun u sameeyeen. 17 Kan dhulka degganow,
waxaa ku hor yaal cabsi iyo yamays iyo dabin. 18 Oo kii
qaylada cabsida ka cararaa yamayskuu ku dhici doonaa, oo
kii yamayska ka soo baxana waxaa qaban doona dabinka,
waayo, waxaa la furay daaqadihii xagga sare, oo aasaaskii
dhulkuna wuu gariirayaa. 19 Dhulkii dhammaantiis wuu
dumay, oo dhulkii kulligiis wuu burburay, oo dhulkii aad iyo
aad buu u dhaqdhaqaaqay. 20 Dhulku wuxuu u dhicdhici
doonaa sida nin sakhraansan, oo waxaa loo dhaqdhaqaajin
doonaa sida buul oo kale. Xadgudubkiisuna wuu ku cuslaan
doonaa, oo wuu dhici doonaa, oo mar dambena sooma kici
doono. 21 Oo waxay maalintaas noqon doontaa in Rabbigu
ciidanka kuwa sare kor ku ciqaabi doono, oo boqorrada
dunidana dhulkuu ku ciqaabi doonaa. 22 Oo iyaga waxaa
laysugu soo ururin doonaa sida maxaabiista godxabsiga
loogu urursho, oo waa la xabbisi doonaa oo maalmo badan
dabadeed ayaa la ciqaabi doonaa. 23 Oo markaasaa dayaxu
isku qasmi doonaa, oo qorraxduna way ceeboobi doontaa,
waayo, Rabbiga ciidammadu boqor buu ku ahaan doonaa
Buur Siyoon iyo Yeruusaalem, isagoo odayaashiisa hortooda
sharaftiisa ka muujinaya.

**25** Rabbiyow, waxaad tahay Ilaahay. Waan ku sarraysiin
doonaa, oo magacaagana waan ammaani doonaa,
waayo, waxaad samaysay waxyaalo yaab badan oo ah
talooyin aad waa hore aaminnimo iyo run ku talaggashay. 2
Waayo, waxaad magaalo ka dhigtay meel tuulan, oo magaalo
deyr lehna burbur, oo daartii weynayd ee shisheeyahana
waxaad ka dhigtay wax aan magaalo ahayn, oo mar dambena
lama dhisi doono. 3 Sidaas daraaddeed dadka xoogga
badanu way ku ammaani doonaan, oo magaalada quruumaha
laga cabsadona way ka cabsan doontaa. 4 Waayo, waxaad
miskiinka u ahayd xoog, oo saboolka baahanna markuu
dhibaataysnaa xoog baad u ahayd, waxaadna ahayd meel
duufaanka laga dugsado oo kulaylkana laga hadhsado
markii kuwa laga cabsado neeftoodu ay ahayd sida duufaan
derbi ku dhacaya. 5 Waxaad hoos u ridi doontaa buuqa

shisheeyayaasha sida kulaylka meesha engegan oo kale.
Sida hooska daruurtu kulaylka u rida ayaa kuwa laga
cabsado gabaygooda hoos loo ridi doonaa. **6** Oo Rabbiga
ciidammadu wuxuu dadyowga oo dhan buurtan ugu samayn
doonaa diyaafad ah baruur miidhan, iyo khamri raagay,
iyo waxyaalo baruur badan oo dhuux ka buuxo, iyo khamri
raagay oo aad loo miiray. **7** Oo isagu wuxuu buurtan ku
baabbi'in doonaa daboolka dadyowga oo dhan la dul saaray
iyo indhashareerta quruumaha oo dhan lagu dul fidiyey. **8**
Oo dhimashadana weligeed buu liqay, Sayidka Rabbiga
ahuna weji kastaba ilmada wuu ka tirtiri doonaa, oo ceebta
dadkiisana dhulka oo dhan wuu ka qaadi doonaa, waayo,
sidaasuu Rabbigu ku hadlay. **9** Oo waxaa maalintaas la
odhan doonaa, Bal eega, waa kan Ilaahayagu. Isagaannu
sugaynay, wuuna na badbaadin doonaa. Kanu waa Rabbiga,
isagaannu sugaynay, oo waxaannu ku farxi oo ku rayrayn
doonnaa badbaadintiisa. **10** Waayo, Rabbiga gacantiisu
waxay saarnaan doontaa buurtan, oo Moo'aabna meeshiisaa
lagula tuman doonaa sida cawska meesha digada lagula
tunto. **11** Oo isna gacmihiisuu ku dhex kala fidin doonaa sida
mid dabaalanaya gacmihiisa u kala fidiyo inuu dabaasho
aawadeed, laakiinse Rabbigu wuxuu hoos u ridi doonaa
kibirkooda iyo shuqulkii gacmahoodaba. **12** Oo qalcadda
dheer oo derbiyadaada adagna wuu dumin doonaa, oo hoos
buu u ridi doonaa, oo dhulka iyo ilaa ciidda, ayuu ku xoori
doonaa.

**26** Oo maalintaas dalka Yahuudah waxaa lagaga gabyi
doonaa gabaygan, Annagu magaalo xoog badan
baannu leennahay, oo Rabbigu wuxuu derbiyo iyo qalcado
nooga dhigi doonaa badbaado. **2** Irdaha fura, quruunta
xaqa ah oo runta xajisa ha soo gashee. **3** Qofkii maankiisu
isku kaa halleeyo nabad dhan baad ku dhawri doontaa,
maxaa yeelay, adiguu ku aaminsan yahay. **4** Rabbiga
weligiinba aamina, waayo, Rabbiga Ilaaha ahu waa dhagax
daa'im ah. **5** Maxaa yeelay, isagaa hoos u soo dejiyey
kuwii meelaha sare degganaa, oo magaaladii sarajoogga
dheeraydna wuu hoosaysiiyey, oo wuxuu hoos ugu soo
dejiyaa tan iyo dhulka, oo ciidduu ku soo xooraa. **6** Oo
cagahaa ku tuman doona, waana cagaha masaakiinta iyo
tallaabooyinka saboolka baahan. **7** Kan xaqa ah jidkiisu
waa qumman yahay oo adigoo qumman ayaa wadiiqada
kan xaqa ah toosiya. **8** Rabbiyow, annagu waxaannu kugu
sugaynay jidka xukummadaada. Oo naftayaduna waxay xiiso
u qabtaa magacaaga iyo xusuustaada. **9** Habeenka naftaydu
adigay kuu xiisootay, oo ruuxa gudahayga ku jira ayaan aad
kuugu doondooni doonaa, waayo, markii xukummadaadu
ay dhulka joogaan ayaa dadka dunida degganu xaqnimo
bartaan. **10** Kan sharka ah haddii raalli laga noqdo isagu
innaba xaqnimo ma barto, oo dalka qummanaanta ayuu
caddaaladdarro ku samayn doonaa, oo haybadda Rabbigana
ma uu fiirin doono. **11** Rabbiyow, gacantaadu kor bay
u taagan tahay, laakiinse iyagu ma ay arkaan illowse
waxay arki doonaan dadaalkaaga aad dadka u dadaashid,
wayna ceeboobi doonaan, oo cadaawayaashaadana dab
baa baabbi'in doona. **12** Rabbiyow, nabad baad na siin
doontaa, oo weliba shuqulladayadii oo dhan baad noo wada
samaysay. **13** Rabbiyow, Ilaahayagow, sayidyo kale oo aan
adiga ahayn ayaa noo talin jiray, laakiinse adiga keliya
ayaannu xusuusannaa oo magacaaga soo qaadnaa. **14** Iyagu
way dhinteen, soona noolaan maayaan, way baabbe'een,
soona sarakici maayaan, oo sidaas daraaddeed waad soo
booqatay oo baabbi'isay, oo xusuustoodii oo dhanna waad
tirtirtay. **15** Quruunta waad kordhisay, Rabbiyow, quruunta
waad kordhisay, oo adiga waa lagu ammaanay, oo dalka
soohdimihiisii oo dhanna waad wada ballaadhisay. **16**
Rabbiyow, markay dhibaataysnaayeen way ku doondooneen,
oo markaad edbinaysayna aad bay kuu baryeen. **17**
Rabbiyow, naag uur leh oo ku soo dhowaatay shinkii ay
dhali lahayd, siday u xanuunsato oo ay foosheeda ugu
qayliso ayaannu hortaada ku noqonnay. **18** Annagu waannu
uuraysannay, oo xanuunkii foosha ayaa na qabtay, oo
waxaannu noqonnay sidii wax dabayl dhalay, oo dhulkana
samatabbixin kuma aannu samayn, oo dadka dunida
degganuna ma ay dhalan. **19** Kuwaagii dhintay way soo
noolaan doonaan, meydadkuna way soo sara kici doonaan.
Kuwiinna ciidda ku dhex jirow, soo toosa oo gabya! Rabbiyow,
dharabkaagu waa sida dharabka geedaha nooleeya, oo
dhulkuna meydadkuu soo xoori doonaa. **20** Dadkaygow,
kaalaya, qolladihiinna gala, oo albaabbadiinna soo xidha, oo
wakhti yar dhuunta, intay cadhadu gudbayso. **21** Waayo,
bal eega, Rabbigu wuxuu meeshiisa uga soo kacayaa inuu
dadka dhulka deggan xumaantooda u ciqaabo. Dhulkuna
wuxuu daaha ka qaadi doonaa dhiiggiisa, oo kuwa la
laayayna mar dambe ma dabooli doono.

**27** Oo wakhtigaas ayaa Rabbigu seeftiisa adag ee weyn
ee xoogga badan ku ciqaabi doonaa Lewiiyaataan
oo ah maska dheereeya, iyo xataa Lewiiyaataan oo ah
maska qalloocan, oo wuxuu dili doonaa bahalka baas ee
badda ku jira. **2** Oo wakhtigaas waxaa la odhan doonaa,
Beerta canabka ee la jecel yahay darandoorri ugu heesa. **3**
Aniga Rabbiga ah ayaa ilaaliya, oo daqiiqad kastana waan
waraabin doonaa. Si aan ciduna wax u yeelin ayaan habeen

iyo maalinba dhawri doonaa. **4** Aniga cadho iguma jirto.
Haddii yamaarugga iyo qodxantu ay dagaal igu soo kicin
lahaayeen, intaan iyaga ku kaco ayaan dhammaantood
wada gubi lahaa. **5** Haddii kalese xooggayga ha la qabsado,
ha layla nabdo, ha layla nabdo. **6** Oo wakhtiga soo socdana
reer Yacquub xidid buu yeelan doonaa, dadka Israa'iilna
waa magooli doonaa oo ubxin doonaa, oo dunida oo dhanna
midhay ka buuxin doonaan. **7** Miyuu isaga wax ugu dhuftay
siduu wax ugu dhuftay kuwii isaga wax ku dhuftay oo kale?
Amase isaga ma la dilay sidii layntii kuwuu laayay oo kale?
**8** Markaad eriday qiyaas baad ku edbisay. Intuu dalka ka
masaafuriyey ayuu maalintii dabaysha bari duufaan adag
ku eryay. **9** Haddaba sidaas daraaddeed xumaanta reer
Yacquub tanaa lagu kafaaraggudi doonaa, oo tanuna waa
midhihii qaadidda dembigiisa oo dhan, markuu dhagaxyada
meesha allabariga oo dhan ka wada dhigo sida dhagaxyada
nuuradda ah oo la burburiyo oo kale, si aanay geedaha
Asheeraah iyo sanamyada qorraxduna mar dambe u soo
kicin. **10** Waayo, magaaladii deyrka lahayd way cidlowday,
waxayna tahay hoy laga kacay, oo waxaa looga tegey sida
cidlada oo kale. Halkaas waxaa daaqi doona weylka, wuuna
jiifsan doonaa, oo wuxuu dhammayn doonaa laamaheeda
oo dhan. **11** Markii laamaheedu engegaan way wada jajabi
doonaan, oo naagaa iman doona oo gubi doona, waayo,
kuwanu waa dad aan innaba waxgarasho lahayn, oo sidaas
daraaddeed kii iyaga uumay uma uu naxariisan doono,
oo kii iyaga sameeyeyna raalli kama ahaan doono. **12** Oo
wakhtigaas Rabbigu hadhuudhkiisuu ku tuman doonaa tan
iyo Webi Yufraad iyo ilaa durdurka Masar, oo reer binu
Israa'iilow, midba mid baa laydiin soo wada ururin doonaa.
**13** Oo wakhtigaas buun weyn baa la yeedhin doonaa, oo
kuwii halligaadda u diyaarsanaa iyo kuwii dalka Masar loo
masaafuriyey waxay ka iman doonaan dalka Ashuur, oo
Rabbigay buurta Yeruusaalem ku caabudi doonaan.

**28** Waxaa iska hoogay taajka kibirka oo sakhraamiinta reer
Efrayim, iyo ubaxa engegay ee quruxdooda weyn oo
ku yaal madaxa dooxada barwaaqaysan ee kuwa khamrigu
ka adkaaday. **2** Bal eega, Sayidku wuxuu leeyahay mid itaal
weyn oo xoog badan. Sida roobdhagaxyaale ah, iyo duufaan
wax burburinaya, iyo sida daad biyo xoog badan oo wax
qarqinaya ayaa gacantiisu dhulka wax ugu xoori doontaa. **3**
Oo taajka kibirka ee sakhraamiinta reer Efrayim ayaa cagaha
lagula tuman doonaa, **4** oo ubaxa engegay oo quruxdooda
weyn oo ku yaal madaxa dooxada barwaaqaysanna wuxuu
noqon doonaa sida berdaha beergoosadka hortiis bislaada,
oo ku alla kii fiiriyaaba markuu arko iska cuno intuu gacantiisa
ku jiro. **5** Oo wakhtigaas Rabbiga ciidammadu wuxuu kuwa
dadkiisa ka hadhay u ahaan doonaa taaj sharaf ah, iyo cigaal
quruxsan, **6** oo kan garsoorid u fadhiyana wuxuu u ahaan
doonaa caddaalad, oo kuwa dagaalka iridda ka celiyana
wuxuu u ahaan doonaa xoog. **7** Laakiinse kuwaasuba khamri
bay ku ambadeen, oo waxay la dhacdheceen wax lagu
sakhraamo. Oo wadaadkii iyo nebigiiba waxay ku ambadeen
wax lagu sakhraamo, oo waxay aad ugu qasmeen khamri,
oo waxay u habaabeen wax lagu sakhraamo. Riyada way ku
ambadaan, oo garsooriddana way ku turunturoodaan. **8**
Waayo, miisaskii oo dhan waxaa ka buuxsamay mantag
iyo wasakh, oo xataa meel keliya oo nadiifsan lama arko.
**9** Bal yuu aqoon bari doonaa? Bal yuuse warka garansiin
doonaa? Ma kuwa caanihii laga gudhiyey oo naasaha laga
duway baa? **10** Waayo, amarba amar, amarba amar baa
lagu daraa, oo qaynuunba qaynuun, qaynuunba qaynuun
baa lagu daraa, halkan in yar, halkaasna in yar. **11** Laakiinse
bushimo dad qalaad iyo af kale ayuu kula hadli doonaa
dadkan **12** uu markii hore ku yidhi, Tanu waa nasasho,
ee kuwa daallan ku nasiya, oo tanuna waa isqabowjintii.
Laakiinse inay maqlaan way diideen. **13** Sidaas daraaddeed
erayga Rabbigu wuxuu iyaga u noqon doonaa amar amar
lagu daray, iyo amar amar lagu daray, qaynuun qaynuun
lagu daray, iyo qaynuun qaynuun lagu daray, halkan in yar,
halkaasna in yar, si ay intay tagaan dib ugu dhacaan, oo ay
u jajabaan, oo ay dabin ugu dhacaan, oo ay u noqdaan kuwa
la qabtay. **14** Haddaba sidaas daraaddeed kuwiinna wax
quudhsada oo dadkan Yeruusaalem deggan u taliyow erayga
Rabbiga maqla. **15** Idinku waxaad tidhaahdeen, Axdi baan
geerida la dhigannay, oo She'oolna heshiis baannu la nahay,
oo markii belaayada wax qarqinaysa ay dhacayso na soo
gaadhi mayso, waayo, been baannu gabbaad ka dhigannay,
oo waxaannu ku hoos dhuumannay daacadla'aan, **(Sheol
h7585)** **16** sidaas daraaddeed Sayidka Rabbiga ahu wuxuu
leeyahay, Bal eega, Siyoon dhagax baan aasaas uga dhigay,
waana dhagax la tijaabiyey, waana dhagax geeseed oo
qaali ah oo aasaas la hubo ah, oo kii isaga rumaystaana
ma degdegi doono. **17** Oo caddaaladna waxaan ka dhigi
doonaa xadhig qiyaaseed, xaqnimona waxaan ka dhigi
doonaa xadhig miisaan leh, oo roobdhagaxyaaluhuna wuxuu
xaaqi doonaa gabbaadka beenta, oo biyuhuna waxay qarqin
doonaan meesha dhuumashada. **18** Oo axdigii aad geerida
la dhigateenna waa la burin doonaa, oo heshiiskiinnii aad
She'ool la lahaydeenna ma hagaagi doono, oo markii
belaayada wax qarqinaysa ay dhacaysona way idinku tuman
doontaa. **(Sheol h7585)** **19** Oo markay dhacaysoba way idin
kaxaysan doontaa, waayo, waxay dhici doontaa subax

ka subax, iyo habeen iyo maalinba, oo in warka la garto
waxay noqon doontaa cabsi uun. 20 Waayo, sariirtu way
ka gaaban tahay in qof isku kala bixin karo, oo aad buu
uga yar yahay wax qof huwan karo. 21 Waayo, Rabbigu
wuxuu u soo kici doonaa siduu Buur Feraasiim ugu kacay,
oo wuxuu u cadhoon doonaa siduu dooxada Gibecoon ugu
cadhooday, inuu sameeyo shuqulkiisa, waana shuqulkiisa
yaabka leh, iyo inuu falintiisa falo, waana falintiisa aan
la fillayn. 22 Haddaba sidaas daraaddeed ha noqonina
kuwa wax quudhsada yaan waxa laydinku xidhay idinku
sii adkaynine, waayo, Sayidka ah Rabbiga ciidammada
waxaan ka maqlay xukunkii baabbi'inta ee uu dhulka oo
dhan la damacsan yahay. 23 Dhegta ii dhiga, oo codkayga
maqla, dhegaysta oo hadalkayga maqla. 24 Kan beerta
jeexa miyuu had iyo goorba beerta u jeexaa inuu wax abuuro
aawadeed? Oo miyuu had iyo goorba beertiisa sii qodaa oo
sii jeexaa? 25 Markuuse beerta ciiddeeda oo dhan wada
simo miyuusan ku firdhin kabsarmadowda, oo miyuusan
kamuunta firdhin, oo sarreenkana miyuusan safsaf u beerin,
iyo shaciirkana meeshiisii, iyo heeddana xagga darafka? 26
Waayo, caqligaas Ilaahiisaa ku tacliimiya, oo isaga bara.
27 Waayo, kabsarmadowda wax af leh laguma tumo, oo
giringirta gaadhiguna kamuunta kuma kor wareegto, laakiinse
kabsarmadowda siiqaa lagu garaacaa, oo kamuuntana ul
baa lagu tumaa. 28 Hadhuudhka kibista waa la tumaa,
laakiinse had iyo goorba siima uu tumi doono, oo ma uu
burburiyo in kastoo giringirta gaadhigiisa iyo fardihiisuba
ay ku tuntaan. 29 Oo taasuna waxay ka timaadaa Rabbiga
ciidammada, kaasoo xagga talada yaab miidhan ah, oo
xagga xigmaddana aad ugu weyn.

**29** Waxaa iska hoogtay Arii'eel, Arii'eel oo ah magaaladii
Daa'uud degay. Sannad ba sannad ku dara, oo
ciiduhuna sidooda ha u soo wareegeen. 2 Markaasaan
Arii'eel dhibi doonaa, oo waxaa jiri doona baroor iyo oohin,
oo waxay ii noqon doontaa sida Arii'eel oo kale. 3 Oo
aniguna waan ku hareerayn doonaa, oo qalcad baan kugu
weerari doonaa, oo waxaan kugu kicin doonaa tuulmooyin.
4 Oo hoos baa laguu soo dejin doonaa, oo dhulkaad ka
dhex hadli doontaa, oo hadalkaaguna isagoo gaaban ayuu
ciidda ka yeedhi doonaa, oo codkaaguna wuxuu ahaan
doonaa sida mid ruuxaan leh oo dhulka ka yeedhaya, oo
hadalkaaguna ciidduu ka shuqshuqlayn doonaa. 5 Laakiinse
shisheeyahaaga badanu waxay noqon doonaan sida boodh,
oo kuwa laga cabsado oo tirada badanuna waxay noqon
doonaan sida buunsho sii bidaya, oo taasuna si kedis ah
ayay dhaqso ugu noqon doontaa. 6 Oo Rabbiga ciidammadu
wuxuu la iman doonaa onkod, iyo dhulgariir, iyo sanqadh
weyn, iyo cirwareen, iyo duufaan, iyo dab ololkiisu wax
baabbi'inayo. 7 Oo quruumaha badan oo Arii'eel la diriraya
oo dhan, kuwaasoo iyada iyo qalcaddeeda la diriraya oo
iyada dhibaba waxay noqon doonaan sida riyo ah wax
habeennimo la arko. 8 Oo waxay noqon doontaa sida nin
gaajaysan oo ku riyooday isagoo wax cunaya, laakiinse
markuu toosay arkay isagoo calooshiisu madhan tahay,
amase sida nin oomman oo ku riyooday isagoo biyo cabbaya
laakiinse markuu soo toosay arkay isagoo itaaldaran oo
aan weli oonbeelin, oo quruumaha Buur Siyoon la diriraya
oo dhammuna sidaas oo kalay wada noqon doonaan. 9
Yaaba, oo naxa, indhihiinna xidha oo indhabbeela. Way
sakhraansan yihiin, laakiinse khamri kuma ay sakhraamin,
way dhacdhacayaan laakiinse wax lagu sakhraamo kuma
ay dhacdhacaan. 10 Waayo, Rabbigu wuxuu idinku riday
hurdo weyn, wuxuuna awday indhihiinnii oo nebiyadii ahaa,
wuxuuna daboolay madaxyadiinnii oo wax arkayaashii ahaa.
11 Oo riyo kastaaba waxay idiin noqotay sidii erayadii qorniin
shaabad lagu xidhay, oo loo dhiibay qof wax akhriyi kara, oo
lagu leeyahay, Waannu ku baryaynaaye kan akhri, oo isna
wuxuu leeyahay, Ma aan akhriyi karo, waayo, shaabad buu
ku xidhan yahay. 12 Oo haddana qorniinkii waxaa loo dhiibaa
mid aan akhris baran, oo waxaa lagu leeyahay, Waannu
ku baryaynaaye kan akhri, oo isna wuxuu leeyahay, Anigu
waxba ma aan akhriyi karo. 13 Haddaba Sayidku wuxuu
yidhi, Dadkanu way ii soo dhowaadaan, oo afkooda iyo
bushimahooda ayay igu maamuusaan, laakiin qalbigooda
way iga fogeeyeen, oo cabsida ay iga qabaanna waa
amarka dadka laga bartay, 14 sidaas daraaddeed bal eega,
waxaan mar kale dadkan dhexdiisa ku sii samayn doonaa
waxyaalo yaab ah, waana waxyaalo yaab iyo naxdinba
leh, oo xigmadda nimankooda xigmadda leh way baabbi'i
doontaa, oo waxgarashada raggooda garashada lehna way
qarsoomi doontaa. 15 Waxaa iska hoogay kuwa taladooda
Rabbiga aad uga qariya, oo shuqulladoodana gudcurka ku
sameeya, oo sii yidhaahda, Bal yaa na arka? Yaase na
og? 16 Waa sidee qalloocnaantiinnu! Dheryasameeyaha
ma in lagu tiriyaa dhoobada, si wixii la sameeyey, uu kii
sameeyey ka yidhaahdo, Isagu ima uu samayn, wixii la
suubbiyeyna uu kii suubbiyey ka yidhaahdo, Isagu waxba
garan maayo? 17 Sow in yaru kama hadhin intay Lubnaan
beer midho badan u rogman doonto, oo beerta midhaha
badanna duud oo kale lagu tirin doono? 18 Oo wakhtigaas
kuwa dhegaha la'u erayada qorniinka ayay maqli doonaan,
oo kuwa indhaha la' indhahooduna wax bay mugdiga iyo
gudcurka ka arki doonaan. 19 Oo kuwa hooseeyaana aad

bay Rabbiga ugu sii farxi doonaan, oo masaakiinta dadka ku
dhex jirtaana waxay ku rayrayn doonaan kan Quduuska ah
ee reer binu Israa'iil. **20** Waayo, kii wax dulmi jiray siima jiri
doono, oo kii wax quudhsan jirayna wuu dhammaan doonaa,
oo kuwa xumaanta suga oo dhanna way baabbi'i doonaan,
**21** kuwaasoo ah kuwa nin hadal aawadiis xumaanfale kaga
dhiga, oo dabinka u dhiga kan iridda ku garnaqa oo kan xaqa
ahna ku leexiya wax aan waxba ahayn. **22** Haddaba Rabbigii
Ibraahim soo furtay wuxuu reer Yacquub ka leeyahay,
Reer Yacquub haatan ceeboobi maayo, oo wejigiisuna mar
dambe cabsi la caddaan maayo. **23** Laakiinse carruurtiisu
markay dhexdooda ku arkaan shuqulka gacmahayga ayay
magacayga quduus ka dhigi doonaan, oo waxay quduus ka
dhigi doonaan kan Quduuska ah ee reer Yacquub, oo waxay
ka cabsan doonaan Ilaaha reer binu Israa'iil. **24** Oo weliba
kuwa xagga ruuxa ka qaldamaa garaad bay yeelan doonaan,
oo kuwa iska gunuunacaana cilmi bay baran doonaan.

**30** Rabbigu wuxuu leeyahay, Waxaa iska hoogay dadka
caasiyiinta ah oo talo aan iga iman ku talaggala, oo
heshiis sameeya laakiinse aan xagga Ruuxayga ahayn,
si ay dembiba dembi ugu sii daran, **2** oo u sii socda inay
Masar galaan, iyagoo aan afkayga waxba weyddiisan, si
ay xoogga Fircoon ugu xoogaystaan, oo ay hooska Masar
isugu halleeyaan! **3** Haddaba sidaas daraaddeed xoogga
Fircoon wuxuu idiin noqon doonaa ceeb, oo iskuhallayntii aad
hooska Masar isku hallayseenna waxay idiin noqon doontaa
sharafjab. **4** Waayo, amiirradiisii Socan bay joogaan, oo
ergooyinkiisiina Xaanees bay yimaadeen. **5** Kulligood waxay
ku ceeboobi doonaan dad aan iyaga waxba u tari karin, oo
aan iyaga u ahayn caawimaad iyo faa'iido toona, laakiinse
ceeb iyo sharafjab u soo jiidi doona. **6** Kanu waa warka culus
ee xayawaanka koonfureed ku saabsan. Waxay maalkooda
dameerro dhabarkooda ugu raraan oo ay khasnadahoodana
awr kuruskeed ugu qaataan dad aan iyaga waxba u tari
doonin, oo waxay dhex maraan dalka dhibka iyo cidhiidhiga
oo ay goosha iyo aarka, iyo jilbiska iyo masduulaaga dabka
lahu ka yimaadaan. **7** Waayo, caawimaadda Masar waa
wax aan waxba tarayn oo aan innaba qasdi lahayn, oo
sidaas daraaddeed waxaan magaceedii u bixiyey Rahabta
iska fadhida. **8** Haddaba tag, oo waxaad hortooda warkan
ku qortaa loox, oo kitaabna ku qor, si uu wakhtiga soo
socda markhaati ugu noqdo weligiis iyo weligiisba, **9** waayo,
kuwanu waa ummad caasiyowday, iyo dad been miidhan ah,
iyo dad aan doonayn inay sharciga Rabbiga maqlaan, **10** oo
waxay waxarkayaasha ku yidhaahdaan, Waxba ha arkina,
oo nebiyadana waxay ku yidhaahdaan, Wax qumman ha noo
sheegina, ee waxaad noo sheegtaan waxyaalo macmacaan
oo khiyaano miidhan ah. **11** Jidka ka leexda, oo wadiiqadana
ka weecda, oo hortayadana kan Quduuska ah ee reer binu
Israa'iil ka fogeeya. **12** Haddaba sidaas daraaddeed kan
Quduuska ah ee reer binu Israa'iil wuxuu leeyahay, Idinku
eraygan waad quudhsataan oo waxaad isku hallaysaan oo
ku tiirsataan dulmi iyo qalloocnaan, **13** sidaas daraaddeed
xumaantanu waxay idiin noqon doontaa sida derbi dheer oo
kala dillaacay oo diyaar u ah inuu dhaco, kaasoo haddiiba si
dhaqso ah u soo dumaya. **14** Oo isna wuxuu u burburin
doonaa sida weelka dheryasameeyahu u burburo oo kale,
isagoo burburinaya oo aan u tudhayn, oo sidaas aawadeed
burburkiisa lagama dhex heli doono jajab dab meeshiisa
lagaga qaado ama biyo berkedda lagaga dhuro. **15** Waayo,
Sayidka Rabbiga ah oo ah kan Quduuska ah ee reer binu
Israa'iil wuxuu yidhi, Soo noqosho iyo nasasho ayaad ku
badbaadi doontaan, oo xasilloonaan iyo kalsooni ayaad
xoog ku yeelan doontaan, laakiinse ma aydaan doonayn.
**16** Laakiinse idinku waxaad tidhaahdeen, Saas ma noqon
doonto, waayo, fardaan ku carari doonnaa, haddaba sidaas
daraaddeed waad carari doontaan. Oo waxaad tidhaahdeen,
Waxaan fuuli doonnaa fardaha dheereeya, haddaba sidaas
aawadeed kuwa idin eryanayaa waxay noqon doonaan kuwa
aad u dheereeya. **17** Kun qof waxay ka carari doonaan mid
qudha cabsigelintiis, idinkuna waxaad ka carari doontaan
shan bajintood, ilaa intiinna hadhay ay noqdaan sida tiir buur
dhaladeed laga taagay iyo sida calan kur dusheed la saaray.
**18** Oo sidaas daraaddeed Rabbigu wuxuu sugayaa inuu idiin
roonaado, oo wuxuu u sarreeyaa inuu idiin naxariisto, waayo,
Rabbigu waa Ilaah caddaalad badan, oo waxaa barakaysan
kuwa isaga sugaya oo dhan. **19** Reer Siyoon oo Yeruusaalem
degganow, mar dambe ma aad ooyi doontaan, waayo,
isagu hubaal aad buu idiinku roonaan doonaa markaad
qaylisaan, oo markuu maqlo wuu idiin jawaabi doonaa.
**20** Oo in kastoo uu Sayidku idin siiyo cuntada dhibta iyo
biyaha silica haddana kuwa wax idin bara mar dambe ma
qarsoomi doonaan, laakiinse indhahiinnu kuwa wax idin bara
way arki doonaan. **21** Oo markaad midigta u leexataan iyo
markaad bidixda u leexataanba waxaad xagga dambe ka
maqli doontaan eray leh, Jidkii waa kan ee ku socda. **22**
Oo weliba waxaad nijaasayn doontaan sanamyadiinna la
qoray oo lacagta lagu dahaadhay, iyo sanamyadiinna la
shubay oo dahabka lagu dahaadhay, oo waxaad iyagu u
xoori doontaan sida wax wasakhaysan, oo waxaad ku odhan
doontaan, Ordoo iska baxa! **23** Oo markaasuu roob idiin
siin doonaa abuurkiinna si aad dhulka ugu abuurtaan, oo
wuxuu cunto idinka siin doonaa waxa dhulka idiinka baxa, oo

waxayna ahaan doontaa barwaaqo badan, oo wakhtigaas
lo'diinnu waxay daaqi doontaa berrimmo balballaadhan.
24 Oo dibida iyo dameeraha dhulka qodaana waxay cuni
doonaan cunto dhanaan oo gacaf iyo fargeeto weyn lagu
haadiyey. 25 Oo wakhtiga laynta weyn oo munaaraduhu
soo wada dhici doonaan buur kasta oo dheer iyo kur kasta
oo dheerba waxaa jiri doona webiyo iyo durdurro biya ah.
26 Oo weliba iftiinka dayaxu wuxuu noqon doonaa sida
nuurka qorraxda, oo nuurka qorraxduna wuxuu toddoba
jibbaar u noqon doonaa sida toddoba maalmood iftiinkood
oo kale, waana maalinta Rabbigu nabarka dadkiisa duubi
doono oo uu dhaawacooda ku dhacay bogsiin doono. 27
Bal eega, Rabbiga magiciisu meel fog buu ka imanayaa,
isagoo cadho la ololaya, oo qiiqiisuna wuu weyn yahay,
oo bushimihiisana dhirif baa ka buuxa, oo carrabkiisuna
waa sida dab wax gubaya. 28 Oo neeftiisuna waa sida
durdur wax qarqinaya, oo xataa tan iyo qoorta gaadhaya,
inuu quruumaha ku kala shaandheeyo shaandho halaag
ah, oo dadka afkiisana waxaa ku jiri doona xakame qalda.
29 Idinku waad gabyi doontaan sida habeen iid quduus ah
la sameeyo, oo qalbigaad ka farxi doontaan sida marka
biibiile loola sii socdo buurta Rabbiga in Kan dhagaxa u
ah reer binu Israa'iil loo tago. 30 Oo Rabbiguna wuxuu
ka dhigi doonaa in codkiisa haybadda badan la maqlo, oo
wuxuu muujin doonaa soodejinta gacantiisa, oo ay la jiraan
dhirifkii cadhadiisa, iyo dab wax gubaya ololkiis, iyo roob
weyn oo kedis ah, iyo duufaan, iyo roobdhagaxyaale. 31
Waayo, kan reer Ashuur oo wax ushiisa ku dhufan jiray
waxaa burburin doona codka Rabbiga, 32 Oo darbad kasta
oo usha loo diyaariyeyba, kaasoo Rabbigu saari doono,
waxaa la jiri doona daf iyo kataarado, oo wuxuu kula diriri
doonaa dagaallo gariir badan. 33 Waayo, Tofed waa horaa
la sii diyaarshay, oo waxaa loo sii hagaajiyey boqorka, oo
aad buu u sii qoday oo uu sii ballaadhiyey, oo waxaa ka
tuullan dab iyo qoryo faro badan, oo waxaa shidaysa neeftii
Rabbiga oo la moodo sida durdur baaruud ah.

**31** Waxaa iska hoogay kuwa Masar caawimaad
ugu dhaadhaca, oo fardo ku kalsoonaada, oo
gaadhifardoodyo isugu halleeya badidooda aawadeed, oo
fardooleyna isugu halleeya xooggooda badan aawadiis,
laakiinse aan Kan Quduuska ah ee reer binu Israa'iil fiirin, oo
aan Rabbigana innaba doondoonin. 2 Laakiinse isaguba
waa xigmad badan yahay, oo belaayuu keeni doonaa, oo
erayadiisana dib uma soo celin doono, laakiinse wuxuu ku
kici doonaa reerka xumaanfalayaasha iyo caawimaadda
kuwa xumaanta sameeya. 3 Haddaba bal ogaada in
Masriyiintu ay binu-aadmi yihiin, oo ayan Ilaah ahayn,
iyo in fardahoodu ay jiidh yihiin, oo ayan ruux ahayn, oo
markii Rabbigu gacantiisa soo fidiyo kan wax caawiyaa
wuu kufi doonaa, kan la caawiyana wuu dhici doonaa, oo
labadooduba way wada halligmi doonaan. 4 Waayo, Rabbigu
wuxuu igu leeyahay, Sida aar libaax iyo libaax yar oo raq
ku kor guuxa, oo markii adhijirro badan loogu yeedho aan
codkooda ka baqin ama aan qayladooda ka cabsan ayaa
Rabbiga ciidammadu u soo degi doonaa inuu Buur Siyoon
iyo kurteeda korkood ku diriro. 5 Sida shimbirro duulaya
ayaa Rabbiga ciidammadu Yeruusaalem u daafici doonaa,
wuu daafici oo wuu samatabbixin doonaa, wuuna u tudhi
doonaa oo badbaadin doonaa. 6 Reer binu Israa'iilow, u soo
noqda kii aad aad uga caasiyowdeen. 7 Waayo, maalintaas
nin kastaaba wuxuu iska xoori doonaa sanamyadiisii lacagta
ahaa iyo sanamyadiisii dahabka ahaa oo ay gacmihiinnu
dembi idiinku sameeyeen. 8 Oo markaas kan reer Ashuur
wuxuu ku le'an doonaa seef aan binu-aadmi ka iman, oo
seefta aan xagga dadka ka iman ayaa dili doonta, oo seeftuu
ka carari doonaa, oo barbaarradiisuna addoommo bay noqon
doonaan. 9 Oo cabsi ayuu qalcaddiisa kala sii gudbi doonaa,
oo amiirradiisuna cabsi aawadeed bay calanka uga carari
doonaan, saas waxaa leh Rabbiga dabkiisu Siyoon ku jiro
oo foornadiisuna ay Yeruusaalem taallo.

**32** Bal eega, boqor baa xaqnimo ku talin doona, oo
amiirrona caddaalad bay wax ku xukumi doonaan. 2 Oo
ninba wuxuu noqon doonaa meel dabaysha lagaga dhuunto
iyo gabbaad duufaanka laga dugsado, iyo sida webiyo biya
ah oo meel engegan ku yaal, iyo sida hoos dhagax weyn
oo dal oommane ah ku yaal. 3 Oo kuwii arka indhahoodu
ma ay awdmi doonaan, oo kuwii maqla dhegahooduna way
dhegaysan doonaan. 4 Oo kuwa wax walba ku degdega
qalbigoodu aqoontuu garan doonaa, oo kuwa gangada leh
carrabkooduna wuxuu diyaar u ahaan doonaa inuu bayaan
u hadlo. 5 Oo mar dambe lama odhan doono, Nacasku
waa gob, oo lama odhan doono, Xoolocirdoonku waa
deeqsi. 6 Waayo, nacasku nacasnimuu ku hadli doonaa, oo
qalbigiisuna xumaan buu samayn doonaa si uu cibaadala'aan
ugu isticmaalo oo uu wax been ah Rabbiga ka sheego, inuu
nafta gaajaysan sii madhiyo oo uu kii oomman cabniinkiisa
gooyo. 7 Oo xoolocirdoonka hubkiisuna waa shar miidhan,
oo wuxuu hindisaa hindisayaal shar ah si uu masaakiinta
erayo been ah ugu baabbi'iyo, xataa haddii saboolku si
qumman u hadlo. 8 Laakiinse deeqsigu wuxuu hindisaa
waxyaalo deeqsinimo ah, oo wuxuu ku sii adkaan doonaa
waxyaalo deeqsinimo ah. 9 Naagaha istareexsanow, kaca,

oo codkayga maqla, gabdhaha aan digtoonaynow, Erayga
dhegta u dhiga. 10 Naagaha aan digtoonaynow, sannad
iyo dhawr maalmood ayaad dhibtoon doontaan, waayo,
canabguriddu ma jiri doonto oo midho-urursiguna ma iman
doono. 11 Naagaha istareexsanow, gariira, oo kuwiinna aan
digtoonaynow, dhibtooda. Ismudhxiya, oo isqaawiya, oo dhar
joonyad ah dhexda ku xidha. 12 Beerihii wanaagsanaa iyo
canabkii midhaha badnaa ee la waayay aawadood ayay
naasahooda u garaaci doonaan. 13 Oo dalka dadkayga iyo
xataa guryaha farxadda oo magaalooyinka faraxsan ku yaal
oo dhan waxaa ka soo bixi doona qodxan iyo yamaarug, 14
maxaa yeelay, daarta boqornimada waa laga tegi doonaa, oo
magaalada dadka badanna waa laga kici doonaa, oo buurta
iyo munaaradduna waxay weligood ahaan doonaan godad
dugaag, iyo farxad dameer banjoog ah, iyo daaqsin idaad,
15 ilaa Ruuxa xagga sare nalagu kor shubo, oo cidladuna ay
noqoto beer midho badan, oo beerta midhaha badanna sida
duud oo kale lagu tiriyo. 16 Oo markaas dabadeed ayaa
caddaaladu cidlada joogi doontaa, oo xaqnimona waxay ku
sii jiri doontaa beerta midhaha badan. 17 Oo xaqnimada
shuqulkeeduna wuxuu ahaan doonaa nabad, xaqnimaduna
weligeed waxay keeni doontaa xasilloonaan iyo kalsooni. 18
Oo dadkayguna waxay joogi doonaan rug nabaadiino, iyo
hoyaal ammaan ah, iyo meelo xasilloon oo lagu nasto. 19
Laakiinse roobdhagaxyaale ahu wuxuu ku soo degi doonaa
duudda, oo magaaladana hoos baa loo soo dejin doonaa. 20
Waxaa barakaysan kuwiinna biyo dhinacyadooda oo dhan
wax ku abuura oo dibiga iyo dameerka u sii daaya inay
daaqaan.

**33** Adaa iska hoogay, kaaga wax dhaca oo aan adiga
wax lagaa dhicin oo wax khiyaaneeya oo aan adiga
lagu khiyaanayn. Markaad waxdhicidda joojisid ayaa adiga
wax lagaa dhici doonaa, oo markaad waxkhiyaanaynta
joojisid ayaa adiga lagu khiyaanayn doonaa. 2 Rabbiyow,
noo roonow, waayo, waannu ku sugaynay, subax kasta
gacan noo ahow, oo wakhtiga dhibaatadana badbaado noo
noqo. 3 Buuqa gurdanka ayaa dadyowgii ka carareen, oo
sarajoogsigaaga ayay quruumihii la kala firdheen. 4 Oo
boolidiinna waxaa loo soo urursan doonaa sida diirtu wax u
ururdone oo kale, oo waxaa loogu boodi doonaa sida ayaxu
ugu boodboodo oo kale. 5 Rabbigu wuu sarreeyaa, waayo,
meel saruu joogaa, oo wuxuu Siyoon ka buuxiyey caddaalad
iyo xaqnimo. 6 Oo wakhtigaaguna wuxuu ahaan doonaa
ammaan, iyo badbaado, iyo xigmad, iyo aqoon miidhan,
oo cabsida Rabbiguna waxay tahay khasnaddiisa. 7 Bal
eega, kuwoodii xoogga badnaa dibadday ka qaylinayaan,
oo ergooyinkii nabadduna si qadhaadh bay u ooyayaan. 8
Jidadkii waaweynaa way baabba'san yihiin, oo dadkii mari
jirayna way ka joogsadeen. Isagu axdigii wuu jebiyey, oo
magaalooyinkiina wuu quudhsaday, oo ninna dan kama
galo. 9 Dalku waa barooranayaa, waana taag gabayaa,
Lubnaan way ceebowday, oo way engegtay, Shaaroon
waa sida lamadegaan oo kale, oo Baashaan iyo Karmelna
caleentii bay daadinayaan. 10 Rabbigu wuxuu leeyahay,
Hadda waan kacayaa, hadda kor baan isu qaadayaa, oo
hadda waan sara marayaa. 11 Waxaad uuraysan doontaan
buunshe, oo waxaad dhali doontaan xaab, oo neeftiinnuna
waa dab idin baabbi'in doona. 12 Oo dadkuna wuxuu noqon
doonaa sida nuurad la shiday, iyo sida qodxan la jaray oo
dab lagu gubay. 13 Kuwiinna fogow, waxaan sameeyey
maqla, oo kuwiinna dhowow, xooggayga aqoonsada. 14
Dembilayaasha Siyoon dhex jooga way cabsanayaan, oo
cibaadalaawayaashuna cabsi bay la gariirayaan, bal keennee
baa dabkan wax gubaya dhex joogi doona? Oo keennee
baa gubasho weligeed ah dhex joogi doona? 15 Kii si
xaqnimo ah u socda, oo si qumman u hadla, oo faa'iidada
dulmiga quudhsada, kii laaluush qaadashadiis ka gacmo
jafjafta, oo maqlidda dhiigdaadinta dhegihiisa ka furaysta, oo
indhihiisana isku qabsada si uusan wax shar ah u arag, 16
kaasu wuxuu fadhiyi doonaa meel sare, oo gabbaadkiisuna
wuxuu noqon doonaa dhufays dhagaxyo ah, oo cuntadiisa
baa la siin doonaa, oo biyihiisuna waxay ahaan doonaan
kuwa la hubo. 17 Indhahaagu waxay arki doonaan Boqorka
oo quruxdiisa huwan, oo waxay arki doonaan dhul ilaa meel
fog kala baxsan. 18 Qalbigaagu wuxuu ka fikiri doonaa
cabsida. Meeh karraanigii wax tirin jiray? Oo meeh kii
baadda miisaami jiray? Oo meeh kii munaaradaha tirin
jiray? 19 Mar dambe ma aad arki doontid dadka cadhada
kulul, ee uusan hadalkoodu kuu dhicin, oo leh af qalaad
oo aadan innaba garan karin. 20 Bal eeg Siyoon oo ah
magaaladii iidaheenna. Indhahaagu waxay arki doonaan
Yeruusaalem oo ah rug xasilloon, iyo teendho aan la qaadi
doonin, oo aan dhidbeheedana weligood la rujin doonin,
oo aan xadhkeheeduna go'i doonin. 21 Laakiinse Rabbiga
haybadda badanu wuxuu halkaas inoogu noqon doonaa
meel webiyo ballaadhan iyo durdurro leh, oo ayan huuriyo
seeb lahu mari doonin, oo aan doonniyaha waaweynuna
dhaafi doonin. 22 Waayo, Rabbigu waa xaakinkeenna, oo
Rabbigu waa taliyaheenna, oo Rabbigu waa boqorkeenna
wuuna ina badbaadin doonaa. 23 Xadhkihii way dabceen, oo
salka daqalkiina lama xoojin karin, shiraaqiina lama kala
fidin karin, markaasaa waxaa la qaybsaday booli badan,
oo curyaankuna wixii la dhacay buu qaatay. 24 Oo kan

halkaas deggan ma odhan doono, Waan bukaa, oo dadka
dhexdeeda degganna xumaantooda waa laga cafiyi doonaa.

**34** Quruumahow, u soo dhowaada si aad wax u
maqashaan, oo dadyowgow, i dhegaysta, dhulka iyo
waxa ka buuxa iyo dunida iyo waxyaalaha ka soo baxa
oo dhammu ha maqleen. **2** Waayo, Rabbigu wuxuu u
cadhaysan yahay quruumaha oo dhan, oo wuxuuna u
dhirifsan yahay ciidammadooda oo dhan. Dhammaantood
wuu wada baabbi'iyey, oo wuxuu iyaga u gudbiyey in la laayo.
**3** Oo weliba kuwoodii la laayayna waa la xoori doonaa, oo
qudhmuunkooduna wuxuu ka soo uri doonaa bakhtigooda,
oo buurahana dhiiggoodaa ka soo qulquli doona. **4** Oo
ciidanka samada oo dhammuna wuu wada idlaan doonaa, oo
samooyinka oo dhanna waa la wada duudduubi doonaa sida
qorniin duudduuban oo kale, oo ciidankooda oo dhammuna
hoos buu u soo daadan doonaa sida caleenu geed canab
ah uga dhacdo iyo sida xabbad berde ahu geed berde
ah uga soo dhacdo. **5** Waayo, seeftaydu samooyinkay
ka dheregtay oo bal eega, waxay ku soo degi doontaa
Edom iyo dadkii aan habaaray inay xukunto. **6** Waayo,
seeftii Rabbiga dhiig baa ka buuxsamay, oo waxay ka
dheregtay baruur, iyo dhiig baraar iyo orgi, iyo baruurta
kelyaha ee wananka, waayo, Rabbigu wuxuu qurbaan ku
samaynayaa Bosraah, oo dalka Edomna layn weyn. **7** Oo
lo'gisiguna iyaguu la dhici doonaa, oo dibida yaryaruna
dibida waaweyn bay la dhici doonaan, oo dalkooduna dhiig
buu ka wabxi doonaa oo ciiddooduna baruur bay ka dhergi
doontaa. **8** Waayo, taasu waa maalinta aarsashada Rabbiga,
iyo sannaddii abaalgudka dacwaddii Siyoon loo qabay. **9**
Oo durdurradooduna waxay u beddelmi doonaan daamur,
oo ciiddooduna waxay u beddelmi doontaa baaruud, oo
dhulkooduna wuxuu noqon doonaa daamur gubanaya. **10**
Oo habeen iyo maalinba lama demin doono, oo qiiqiisuna
weligiisba kor buu u bixi doonaa, oo tan iyo ab ka abna cidla
ayuu ahaan doonaa, oo weligiis iyo weligiisba ciduna ma
dhex mari doonto. **11** Laakiinse waxaa iska hantiyi doona
cantalyaaga iyo caanaqubta, oo waxaa dhexdiisa degganaan
doona guumays iyo tuke, oo isna wuxuu korkiisa ku fidin
doonaa xadhigga qiyaaseed ee qasnaanta, iyo xadhigga
miisaanka leh ee baabbi'inta. **12** Raggiisa gobta ah waxaa
loogu yeedhi doonaa boqortooyada, laakiinse midkoodna
halkaas ma joogi doono, oo amiirradiisa oo dhammuna
waxba ma ay ahaan doonaan. **13** Oo daarihiisa waaweynna
waxaa ka soo bixi doona qodxan, oo qalcadihiisana waxaa
ka soo bixi doona maraboob iyo yamaarug, oo waxay noqon
doonaan dawacooyin rugtood, iyo barxad gorayo daaqdo. **14**
Oo xayawaanka lamadegaankuna waxay halkaas kula kulmi
doonaan yeyda, bahalka dhogorta dheer lehna wuxuu u
qaylin doonaa wadaygiis, oo guumaysuhuna halkaasay degi
doonaan, oo waxay nafsaddooda u heli doonaan meel ay ku
nastaan. **15** Oo abeesaduna halkaasay buul ka samaysan
doontaa, oo ukunteeda ku dhali doontaa, oo ku dillaacin
doontaa, oo waxay ku soo ururin doontaa hooskeeda,
oo gorgoraduna halkaasay ku soo ururi doonaan, oo mid
kastaaba waxay la jiri doontaa ka qaba. **16** Bal doondoona
kitaabka Rabbiga oo akhriya. Waxyaalahaas miduna kama
baaqan doonto, oo midunaba ka qaba ma waayi doonto,
waayo, Rabbiga afkiisaa amray oo waxaa iyaga soo ururiyey
Ruuxiisa. **17** Oo isagaa saamiga u tuuray, oo gacantiisaa
xadhig qiyaaseed ugu qaybisay, oo iyana weligoodba way
iska hantiyi doonaan, oo tan iyo ab ka abna way dhex
degganaan doonaan.

**35** Cidlada iyo dhulka engeganuba way farxi doonaan,
oo lamadegaankuna wuu rayrayn doonaa, oo wuxuu u
magooli doonaa sida ubaxnarjiska. **2** Aad iyo aad buu u
magooli doonaa, oo xataa wuxuu ku rayrayn doonaa farxad
iyo gabay, oo waxaa la siin doonaa ammaantii Lubnaan
iyo haybaddii Karmel iyo Shaaroon. Waxaa la arki doonaa
ammaanta Rabbiga iyo haybadda Ilaaheenna. **3** Gacmaha
taagta daran xoogeeya, oo jilbaha tabarta yarna adkeeya. **4**
Kuwa qalbigoodu cabsanayo waxaad ku tidhaahdaan, Xoog
yeesha oo ha cabsanina, waayo, Ilaahiinnu wuxuu la iman
doonaa aarsasho iyo abaalmarintii Ilaah, wuu iman doonaa,
wuuna idin badbaadin doonaa. **5** Oo markaasaa kuwa
indhaha la' indhahoodu furmi doonaan, oo kuwa dhegaha la'
dhegahooda furka laga bixin doonaa. **6** Oo markaasaa ninkii
curyaan ahu wuxuu u boodboodi doonaa sida deerada oo
kale, oo kii carrab la' carrabkiisuna wuu gabyi doonaa, waayo,
cidlada biyaa ka soo burqan doona, oo lamadegaankana
durdurraa ka soo bixi doona. **7** Oo dhulkii engegay wuxuu
noqon doonaa balli, oo dalkii oommanaha ahaana wuxuu
noqon doonaa ilo biyo ah, oo rugtii dawacooyinku jiifsan
jireenna waxaa ka soo bixi doona caws iyo gobays iyo
dareemo. **8** Oo waxaa halkaas jiri doona jid weyn, oo waxaa
jidka loo bixin doonaa Jidkii Quduusnimada, kuwa aan
daahirsanaynuna ma mari doonaan, laakiinse waxaa leh
kuwa isaga jidka la socda, oo xataa nacasyaduna kuma
qaldami doonaan. **9** Oo halkaas libaax ma jiri doono, oo bahal
dugaag ahuna ma mari doono, oo innaba iyaga halkaas
lagama heli doono, laakiinse waxaa jidkaas mari doona
kuwa la soo furtay. **10** Oo kuwii Rabbigu soo madaxfurtayna
way soo noqon doonaan, oo iyagoo gabyaya oo weligoodba

aad u faraxsan ayay Siyoon iman doonaan, oo waxay heli
doonaan farxad iyo rayrayn, oo caloolxumo iyo taahiduna
way iska dhammaan doonaan.

**36** Haddaba Boqor Xisqiyaah sannaddiisii afar iyo tobnaad
ayaa Seenxeeriib oo ahaa boqorkii Ashuur ku kacay
magaalooyinkii deyrka lahaa oo dalka Yahuudah oo dhan,
wuuna qabsaday. 2 Oo boqorkii Ashuurna wuxuu Laakiish
ka diray Rabshaaqeeh oo ciidan faro badan wata, oo wuxuu
Boqor Xisqiyaah ugu diray Yeruusaalem. Oo wuxuu is
ag taagay biyomareenkii balliga sare kaasoo ku dhex yiil
waddada berrinkii dharmaydhaha. 3 Oo markaasaa waxaa u
soo baxay Elyaaqiim ina Xilqiyaah oo reerka u sarreeyey,
iyo Shebnaa oo karraaniga ahaa, iyo Yoo'aax ina Aasaaf
oo ahaa taariikhqorihii. 4 Markaasaa Rabshaaqeeh wuxuu
iyagii ku yidhi, Waxaad Xisqiyaah haddeer ku tidhaahdaan,
Boqorka weyn ee boqorka Ashuur ah wuxuu kugu leeyahay,
War waxaad ku kalsoon tahay oo aad isku hallaynaysaa
waa maxay? 5 Waxaan kugu leeyahay, Waxaad tidhaahdaa,
Dagaal waxaa loo hayaa talo iyo xoog, laakiin afka uun baad
ku tidhi. Haddaba waadiga iga fallaagoobaye bal yaad isku
hallaynaysaa? 6 Bal ogow, waxaad isku hallaynaysaa oo ul
ahaan u qaadanaysaa cawsduurkan burburay, kaasoo ah
Masar, oo isna haddii nin ku tiirsado gacantuu ka galaa oo
ka mudaa, oo boqorka Masar oo Fircoon ahu saasoo kaluu
u yahay kuwa isaga isku halleeya oo dhan. 7 Laakiinse
haddaad igu tidhaahdid, Waxaannu isku hallaynaynaa
Rabbiga Ilaahayaga ah, miyuusan isagu ahayn kii meelihiisii
sare iyo meelihiisii allabarigaba uu Xisqiyaah wada dumiyey
isagoo dadka Yahuudah iyo dadka Yeruusaalemba ku
leh, Meeshan allabariga horteeda waa inaad Ilaah ku
caabuddaan? 8 Haddaba waan ku baryayaaye bal sharad la
dhigo sayidkayga oo ah boqorka Ashuur, haddaba waxaan
ku siin doonaa laba kun oo faras, haddaad rag fuula u
heli kartid. 9 Bal sidee baad u celin kartaa sirkaal ka
mid ah kuwa ugu yaryar ee addoommada sayidkayga, oo
sidee baad Masar isugu hallaynaysaa inay ku siinayso
gaadhifardood iyo rag fardooley ah? 10 Haddaba miyaan
Rabbiga la'aantiis ugu kacay meeshan inaan baabbi'iyo?
Rabbigu wuxuu igu yidhi, Dalkaas ku kac oo soo baabbi'i.
11 Markaasaa Elyaaqiim iyo Shebnaa iyo Yoo'aax waxay
Rabshaaqeeh ku yidhaahdeen, Waannu ku baryaynaaye
nagula hadal afka reer Suuriya, annagoo addoommadaada
ah, waayo, isagaannu garanaynaa, oo ha nagula hadlin afka
Yuhuudda iyadoo dadka derbiga dul jooga ay na maqlayaan.
12 Laakiinse Rabshaaqeeh wuxuu iyagii ku yidhi, Sayidkaygu
ma wuxuu ii soo diray inaan sayidkiinna iyo idinka erayadan
kula hadlo? Sow iima uu soo dirin nimanka derbiga dul
joogaa inay saxaradooda cunaan oo ay kaadidooda idinla
cabbaan? 13 Markaasuu Rabshaaqeeh istaagay, oo intuu
cod weyn ku qayliyey ayuu afka Yuhuudda ku hadlay oo
yidhi, War maqla erayadii boqorka weyn ee ah boqorka
Ashuur. 14 Boqorkii wuxuu idinku leeyahay, Xisqiyaah yuusan
idin khiyaanayn, waayo, isagu ma uu awoodi doono inuu idin
samatabbixiyo. 15 Oo weliba Xisqiyaah yuusan Rabbiga idin
aaminsiin isagoo leh, Hubaal Rabbigu waa ina samatabbixin
doonaa, oo magaaladan laguma ridi doono gacanta boqorka
Ashuur. 16 Haddaba Xisqiyaah ha maqlina, waayo, boqorkii
Ashuur wuxuu leeyahay, Nabad ila dhigta, oo ii soo baxa, oo
midkiin waluba wax ha ka cuno canabkiisa iyo geedkiisa
berde, oo midkiin waluba ha cabbo biyaha ceelkiisa, 17
intaanan iman oo idiin kaxayn dal dalkiinna la mid ah, oo ah
dal hadhuudh iyo khamri leh, oo ah dal kibis iyo beerocanab
leh. 18 Iska jira oo yuusan Xisqiyaah idin sasabin isagoo leh,
Rabbigu waa ina samatabbixin doonaa. Waayo, quruumaha
ilaahyadoodii midkoodna miyuu dalkiisii ka samatabbixiyey
gacanta boqorka Ashuur? 19 Bal meeye ilaahyadii Xamaad
iyo Arfaad? Oo meeye ilaahyadii Sefarwayiim? Iyagu miyey
Samaariya ka samatabbixiyeen gacantayda? 20 Bal waa
kuwee kuwa ku jira ilaahyada dalalka oo dhan oo dalkooda
ka samatabbixiyey gacantayda? Haddaba Rabbigu sidee
buu Yeruusaalem gacantayda uga samatabbixin karaa? 21
Laakiinse way iska aamuseen oo xataa eray keliya uguma
ay jawaabin, waayo, boqorku wuxuu ku amray oo yidhi,
Ha u jawaabina. 22 Markaasaa waxaa Xisqiyaah u yimid
Elyaaqiim ina Xilqiyaah oo reerka u sarreeyey, iyo Shebnaa
oo karraanigii ahaa, iyo Yoo'aax ina Aasaaf oo taariikhqorihii
ahaa, iyagoo dhar jeexjeexan, oo waxay isagii u sheegeen
Rabshaaqeeh erayadiisii.

**37** Oo markii Boqor Xisqiyaah taas maqlay intuu dharkiisii
jeexjeexay oo joonyad guntaday ayuu gurigii Rabbiga
galay. 2 Markaasuu Elyaaqiim oo reerka u sarreeyey, iyo
Shebnaa oo karraanigii ahaa, iyo duqowdii wadaaddada
iyagoo joonyado qaba u diray Nebi Ishacyaah oo ahaa ina
Aamoos. 3 Oo iyana waxay ku yidhaahdeen, Xisqiyaah wuxuu
kugu leeyahay, Maanta waa maalin dhibaato, iyo canaan, iyo
cay, waayo, carruurtii way dhalan lahayd, laakiinse xoog lagu
dhalaa ma jiro. 4 Waxaa laga yaabaa in Rabbiga Ilaahaaga
ahu uu wada maqlo erayadii Rabshaaqeeh, kaasoo sayidkiisii
ahaa boqorka Ashuur uu u soo diray inuu caayo Ilaaha nool,
waana suurtowdaa inuu Rabbiga Ilaahaaga ahu canaanto
kan uu erayadiisii maqlay, haddaba sidaas daraaddeed
u ducee kuwa hadhay. 5 Sidaas daraaddeed Boqor

Xisqiyaah addoommadiisii waxay u yimaadeen, Ishacyaah.
6 Oo Ishacyaah wuxuu ku yidhi, Waxaad sayidkiinnii ku
tidhaahdaan, Rabbigu wuxuu ku leeyahay, Ha ka cabsan
erayadii aad maqashay oo midiidinnadii boqorka Ashuur ay
igu caayeen. 7 Bal ogow, ruux baan gelin doonaa, oo belef
buu maqli doonaa, markaasuu ku noqon doonaa dalkiisii, oo
waxaan ka dhigi doonaa in seef lagu dilo, isagoo dalkiisii
jooga. 8 Markaasaa Rabshaaqeeh intuu noqday wuxuu
helay boqorkii Ashuur oo la diriraya Libnaah, waayo, wuxuu
maqlay inuu Laakiish ka tegey. 9 Oo markuu maqlay iyadoo
la leeyahay, Boqorka Itoobiya oo Tirhaaqaah ah ayaa kugu
soo baxay si uu kuula diriro, ayuu haddana wargeeyayaal
u diray Xisqiyaah isagoo leh, 10 Xisqiyaah oo ah boqorka
dalka Yahuudah waxaad ku tidhaahdaan, Ilaahaaga aad
isku hallaysaa yuusan ku khiyaanayn, isagoo kugu leh,
Yeruusaalem gacanta loo gelin maayo boqorka Ashuur. 11
Bal eeg, waad maqashay wixii ay boqorrada Ashuur dalalkan
oo dhan ku sameeyeen iyo sidii ay dhammaantood u wada
baabbi'iyeen, haddaba adiga ma lagu samatabbixinayaa? 12
Quruumihii ay awowayaashay baabbi'iyeen ilaahyadoodii
miyey samatabbixiyeen kuwaasoo ahaa Goosaan, iyo
Xaaraan, iyo Resef, iyo reer Ceeden oo Telasaar degganaa?
13 Oo bal meeye boqorkii Xamaad, iyo boqorkii Arfaad,
iyo boqorkii magaalada Sefarwayiim, iyo kii Xeenac iyo kii
Ciwaah? 14 Markaasaa Xisqiyaah warqaddii ka qaaday
gacantii wargeeyayaashii oo akhriyey, dabadeedna wuxuu
tegey gurigii Rabbiga, oo warqaddii ku kala bixiyey Rabbiga
hortiisa. 15 Oo Xisqiyaah wuxuu baryay Rabbiga, oo yidhi, 16
Rabbiyow, Rabbiga ciidammadow, Ilaaha reer binu Israa'iil,
kan keruubiimta ku dul fadhiyow, waxaad tahay Ilaah, oo
adiga keligaa ayaa ah Ilaaha boqortooyooyinka dunida oo
dhan, oo cirka iyo dhulkana adigaa sameeyey. 17 Rabbiyow,
dhegta u dhig oo maqal, oo Rabbiyow, indhahaaga fur oo
arag, bal maqal Seenxeeriib erayadii uu u soo diray inuu
Ilaaha nool ku caayo oo dhan. 18 Rabbiyow, sida runta ah
boqorrada Ashuur waxay baabbi'iyeen quruumihii oo dhan
iyo dalalkoodiiba, 19 oo ilaahyadoodiina dab bay ku dhex
tuureen, waayo, iyagu ilaahyo ma ay ahayn, laakiinse waxay
ahaayeen wax gacanta lagu sameeyey, oo ahaa qoryo iyo
dhagaxyo, oo sidaas daraaddeed iyagu way baabbi'iyeen.
20 Haddaba sidaas daraaddeed, Rabbiyow, Ilaahayagow,
gacantiisa naga badbaadi, in boqortooyooyinka dunida
oo dhammu ay ogaadaan inaad adiga keliyuhu Rabbiga
tahay. 21 Markaasaa Ishacyaah ina Aamoos u soo cid diray
Xisqiyaah, oo wuxuu ku yidhi, Rabbiga Ilaaha reer binu
Israa'iil ahu wuxuu leeyahay, Seenxeeriib oo ah boqorka
Ashuur waad iga bariday, 22 taas aawadeed Rabbigu wuxuu
ku hadlay eraygan isaga ku saabsan, Gabadha bikradda
ah oo Siyoon ahu Way ku fududaysatay, oo intay kugu
qososhay ayay ku quudhsatay, Yeruusaalem madaxay kaa
ruxatay. 23 Bal adigu kumaad yaraysatay oo aad cayday?
Oo bal yaad codkaaga kor ugu qaadday Oo aad indhahaaga
ku taagtay? Waa kan quduuska ah oo reer binu Israa'iil. 24
Addoommadaada ayaad Sayidka ku cayday Oo waxaad
tidhi, Gaadhifardoodkayga badan Ayaan ku soo fuulay
buuraha meesha ugu dheer, Iyo meelaha ugu hooseeya ee
Lubnaan gudaheeda, Oo waxaan jari doonaa geedaheeda
dhaadheer oo kedarka ah, iyo geedaheeda la doortay oo
berooshka ah, Oo waxaan geli doonaa meeshiisa ugu
dheer oo fog iyo kaynta berrinkeeda oo midhaha badan.
25 Anigu waan qoday oo biyaan cabbay, Oo calaacalaha
cagahayga baan ku wada qallajin doonaa Webiyaasha
Masar oo dhan. 26 War sow ma aad maqal Sidaan waa hore
u sameeyey, Oo aan wakhtiyadii hore u qabanqaabiyey?
Haddaba anigaa saas ka yeelay Inaad magaalooyin deyr leh
baabbi'isid oo aad ka dhigtid taallooyin burbur ah. 27 Oo
sidaas daraaddeed dadkii degganaa way xoog yaraayeen,
Wayna naxeen oo wareereen, Oo waxay ahaayeen sida
cawska berrinka, iyo sida doogga, iyo sida cawska guryaha
korkooda ka soo baxa, iyo sida hadhuudh intaanu korin.
28 Laakiinse waan aqaan fadhigaaga, iyo bixiddaada, iyo
soo geliddaada, iyo cadhadaadii aad ii cadhootayba. 29
Cadhadaadii aad ii cadhootay Iyo islaweynaantaadii waxay
soo gaadheen dhegahayga, Oo sidaas daraaddeed sanka
waxaan kaa sudhi doonaa qabatadayda, Bushimahaagana
waxaan gelin doonaa xakamahayga, Oo waxaan kugu celin
doonaa jidkii aad ku timid. 30 Oo tanu waxay kuu ahaan
doontaa calaamad, sannaddan waxaad cuni doontaan waxa
iska soo baxa, oo sannadda labaadna waxaad cuni doontaan
wax kii hore uun ka soo baxay, oo sannadda saddexaadna
idinku wax beerta, oo haddana goosta, oo beero canab ah
tabcada, oo midhahooda cuna. 31 Markaasay kuwii hadhay
oo reer Yahuudah ka baxsaday mar kalay xididdo hoos u
bixin doonaan, midhona kor bay u dhali doonaan. 32 Waayo,
Yeruusaalem waxaa ka soo bixi doona kuwa hadhi doona, oo
Buur Siyoonna waxaa ka soo bixi doona kuwa baxsan doona,
oo qiirada Rabbiga ciidammada ayaa taas samayn doonta.
33 Haddaba Rabbigu saasuu uga hadlay boqorka Ashuur oo
yidhi, Isagu magaaladan iman maayo, fallaadhna ku soo
gani maayo, horteedana gaashaan la iman maayo, taallo
ciid ahna ag tuuli maayo. 34 Oo Rabbigu wuxuu leeyahay,
Jidkuu ku yimid ayuu ku noqon doonaa, oo magaaladan
iman maayo. 35 Waayo, anigu magaaladan waxaan u
daafici doonaa oo u badbaadin doonaa aniga daraadday iyo

addoonkaygii Daa'uud daraaddiis. **36** Markaasaa malaa'igtii
Rabbigu baxday oo waxay xeradii reer Ashuur ka laysay
boqol iyo shan iyo siddeetan kun oo nin, oo aroor hore
markii la toosay waxay wada ahaayeen meyd. **37** Markaasaa
Seenxeeriib oo ahaa boqorkii Ashuur intuu tegey Nineweh
ku noqday oo degay. **38** Oo markuu wax ku caabudayay
gurigii ilaahiis Nisrog ayay wiilashiisii oo ahaa Adrammeleg
iyo Shareser isagii seef ku dileen, markaasay u carareen
dalkii Araarad. Oo meeshiisiina waxaa boqor ka noqday
wiilkiisii Eesar Xaddoon.

**38** Oo waagaas ayaa Xisqiyaah bukooday, oo geeri buu
u dhowaaday. Markaasaa Nebi Ishacyaah ina Aamoos
u yimid, oo wuxuu ku yidhi, Rabbigu wuxuu leeyahay,
Reerkaaga la dardaaran, waayo, waad dhimanaysaa oo sii
noolaan maysid. **2** Markaasaa Xisqiyaah wejigiisii derbiga
ku sii jeediyey, oo Rabbiga baryay oo yidhi, **3** Rabbiyow,
waan ku baryayaaye, bal haatan xusuuso sidaan hortaada
ugu socday runta iyo qalbi qumman, iyo sidaan u sameeyey
waxa hortaada ku wanaagsan. Xisqiyaahna aad buu u
ooyay. **4** Markaasaa eraygii Rabbigu u yimid Nebi Ishacyaah
oo ku yidhi, **5** Tag, oo waxaad Xisqiyaah ku tidhaahdaa,
Rabbiga ah Ilaaha awowgaa Daa'uud wuxuu leeyahay,
Baryootankaagii waan maqlay, ilmadaadiina waan arkay,
haddaba cimrigaagiina waxaan kuugu dari doonaa shan
iyo toban sannadood. **6** Oo adiga iyo magaaladanba
waan ka samatabbixin doonaa gacanta boqorka Ashuur,
oo magaaladanna waan daafici doonaa. **7** Oo haddaba
calaamadda xagga Rabbiga kaaga imanaysa in Rabbigu
samaynayo wixii uu Rabbigu ballanqaaday waxay ahaan
doontaa tan: **8** bal eeg, waxaan dib u soo celin doonaa
hooska derejooyinka, intuu hore uga socday toban derejo
oo ah derejooyinkii Aaxaas. Sidaasay qorraxdu dib ugu
soo noqotay toban derejo oo ay hore u dhaaftay. **9** Kanu
waa qorniinkii Xisqiyaah oo ahaa boqorkii dalka Yahuudah,
oo uu qoray markuu bukay, oo uu haddana cudurkiisii ka
bogsaday. **10** Anigu waxaan is-idhi, Cimrigayga oo badh ah
ayaan irdihii She'ool sii mari doonaa, Oo intii cimrigayga
ka hadhayna waa layga qaaday. **(Sheol h7585)** **11** Waxaan
is-idhi, Ma aan arki doono Rabbiga, kaasoo ah Rabbiga
dalka kuwa nool jooga, Mar dambena ma arki doono qof
ka mid ah dadka dunida deggan. **12** Rugtaydii waa layga
fogeeyey, oo sidii adhijir teendhadiis ayaa la iiga qaaday.
Sida dharsameeye ayaan noloshaydii u duudduubay, oo
wuxuu iga gooynayaa alaabtiisa uu dharka ku sameeyo, Oo
maalin ilaa habeenba waad i sii dhammaystiraysaa. **13** Oo
tan iyo aroortii ayaan fikirayay, isagu lafahayga oo dhan ayuu
u jejebiyaa sida libaax oo kale, Oo maalin ilaa habeenba
waad i sii dhammaystiraysaa. **14** Sidii dabafallaadh iyo
saratoosiye oo kale ayaan u dhawaaqay. Oo waxaan u
baroortay sidii qoolley oo kale, oo indhahaygu daal bay
la gudheen sidaan kor u fiirinayay, Rabbiyow, waa lay
dulmay, ee i caawi. **15** Haddaba bal maxaan idhaahdaa?
Isagu wuu ila hadlay, oo weliba isaga qudhiisaa waxan
sameeyey. Haddaba cimrigayga oo dhan tartiib baan u socon
doonaa qadhaadhka naftayda aawadiis. **16** Sayidow, dadku
waxyaalahanuu ku nool yahay, Oo ruuxa noloshayduna
wuxuu ku jiraa waxyaalahan oo dhan. Haddaba i bogsii,
oo i noolaysii. **17** Bal eeg, nabadgelyadayda aawadeed
ayaan qadhaadh weyn u qabay, Laakiinse naftayda waad
jeclaatay, oo sidaas daraaddeed yamayskii qudhunka waad
ka samatabbixisay, Waayo, dembiyadaydii oo dhan waxaad
ku tuurtay gadaashaada. **18** Waayo, She'ool kuguma
mahadnaqi karo, oo dhimashaduna kuma ammaani karto,
Oo kuwa yamayska hoos ugu dhacana runtaada rajo
kama qabi karaan. **(Sheol h7585)** **19** Kan nool, kan nool
oo keliya ayaa kugu mahadnaqi doona sidaan aniguba
maanta yeelayo. Aabbuhu wuxuu runtaada ogeysiin doonaa
carruurtiisa. **20** Rabbigu waa u diyaar inuu i badbaadiyo,
Haddaba sidaas daraaddeed annagu cimriga noloshayada
oo dhan Waxaannu guriga Rabbiga ku dhex gabyi doonnaa
gabayadayda annagoo alaab xadhko leh ku cayaarayna. **21**
Nebi Ishacyaah wuxuu yidhi, Ha la qaado fud berde ah, oo
kasoobaxa ha la saaro, oo isna wuu bogsan doonaa. **22**
Oo weliba Xisqiyaahna wuxuu yidhi, Maxaa calaamad ii ah
inaan guriga Rabbiga u kici doono?

**39** Waagaas Merodag Baladaan oo ahaa ina Baladaan,
oo boqorkii Baabuloon ahaa ayaa warqado iyo hadiyad
Xisqiyaah u soo diray, waayo, wuxuu maqlay inuu bukay
oo haddana bogsaday. **2** Oo Xisqiyaahna aad buu iyagii
ugu farxay, oo wuxuu tusay gurigii ay yiilleen waxyaalihiisii
qaaliga ahaa, kuwaasoo ahaa lacagtii, iyo dahabkii, iyo
uunsigii, iyo saliiddii qaaliga ahayd, iyo gurigiisii hubka oo
dhan, iyo kulli waxyaalihii khasnadihiisa ku jiray oo dhan. Oo
Xisqiyaah wax uusan iyaga tusin laguma arag gurigiisa iyo
dowladdiisa oo dhan. **3** Markaasaa Nebi Ishacyaah u yimid
Boqor Xisqiyaah, oo wuxuu ku yidhi, War nimankanu maxay
yidhaahdeen? Xaggee bayse kaaga yimaadeen? Kolkaasaa
Xisqiyaah yidhi, Waxay iiga yimaadeen dal fog, kaasoo ah
Baabuloon. **4** Markaasuu ku yidhi, Maxay gurigaaga ku
arkeen? Oo Xisqiyaah wuxuu ugu jawaabay, Way wada
arkeen waxa gurigayga yaal oo dhan, oo khasnadahayga
kuma jiraan wax aanan tusin. **5** Kolkaasaa Ishacyaah wuxuu

Xisqiyaah ku yidhi, Haddaba bal maqal erayga Rabbiga
ciidammada. 6 Bal eeg, waxaa iman doona maalmaha
waxa gurigaaga yaal oo dhan iyo wixii ay awowayaashaa
ilaa maantadan kaydiyeen Baabuloon loo qaadan doono.
Rabbigu wuxuu leeyahay, Waxba ma hadhi doonaan. 7
Wiilashaada kaa soo bixi doona, oo aad dhali doontana
waa la kaxaysan doonaa, oo iyana waxay ahaan doonaan
bohommo jooga daarta boqorka Baabuloon. 8 Markaasaa
Xisqiyaah wuxuu Ishacyaah ku yidhi, Erayga Rabbiga oo
aad ku hadashay waa wanaagsan yahay. Oo weliba wuxuu
kaloo yidhi, Waayo, waxaa jiri doona nabad iyo run intaan
noolahay.

**40** Ilaahiinnu wuxuu leeyahay, Dadkayga qalbi qaboojiya
oo sii qalbi qaboojiya! 2 Yeruusaalem qalbigeeda la
hadla, oo iyada u qayliya oo u sheega in dagaalkeedu
dhammaaday, iyo in xumaanteeda laga saamaxay, iyo inay
dembiyadeedii oo dhan aawadood laba jibbaar gacantii
Rabbiga uga heshay. 3 Waxaa yeedhaya mid qaylinaya
codkiis oo leh, Jidkii Rabbiga cidlada dhexdiisa ka hagaajiya,
oo lamadegaanka dhexdiisa jid weyn Ilaahayaga aawadiis
uga toosiya. 4 Dooxo walba kor baa loo qaadi doonaa,
oo qar iyo buur walbana waa la gaabin doonaa, waxa
qalloocanna waa la toosin doonaa, oo meelaha xunxunna
waxaa laga dhigi doonaa bannaan siman, 5 oo waxaa la
muujin doonaa ammaanta Rabbiga, uunka oo dhammuna
way wada arki doonaan, waayo, afkii Rabbiga ayaa saas ku
hadlay. 6 Waxaa yeedhaya codka kan leh, Qayli. Oo isna
wuxuu yidhi, Maxaan ku qayliyaa? Wax kasta oo jiidh lahu
waa caws, oo wanaagsanaantiisa oo dhammuna waa sida
ubaxa duurka oo kale. 7 Cawsku wuu engegaa, ubaxuna
wuu dhacaa, maxaa yeelay, neefta Rabbigu way afuuftaa,
sida xaqiiqada ah dadku waa caws oo kale. 8 Cawsku wuu
engegaa, ubaxuna wuu dhacaa, laakiinse erayga Ilaaheennu
weligiisba wuu waari doonaa. 9 Kaaga warka wanaagsan
Siyoon u keenayow, buurta dheer kor u sii fuul, kaaga
warka wanaagsan Yeruusaalem keenayow, codkaaga kor
xoog ugu qaad, kor u sii qaad, oo innaba ha cabsan. Oo
magaalooyinka dalka Yahuudah waxaad ku tidhaahdaa,
War bal Ilaahiinna eega! 10 Bal eega, Sayidka Rabbiga ahu
wuxuu la iman doonaa xoog weyn, oo gacantiisaa wax isaga
ugu talin doonta! Bal eega, abaalgudkiisii wuu wadaa oo
abaalmarintiisuna way ka soo horraysaa. 11 Isagu adhigiisuu
u daajin doonaa sida adhijir oo kale, naylahana gacantiisuu
ku ururin doonaa, oo wuxuu ku qaadi doonaa laabtiisa, oo
kuwa la nuugana qunyar buu u hor kici doonaa. 12 Bal yaa
biyaha sacabkiisa godan ku qiyaasay, oo samada taako ku
qiyaasay, oo ciidda dhulka miisaan ku qiyaasay, oo buuraha
miisaammo saaray, oo kurahana kafado ku miisaamay? 13
Bal yaa Ruuxa Rabbiga la taliyey? Bal yaase intuu lataliyihiisii
noqday isaga wax baray? 14 Bal yuu isagu la tashaday? Oo
bal yaa tacliimiyey, oo dhabbaha caddaaladda baray? Oo
yaa aqoon baray, oo jidka waxgarashada tusay? 15 Bal eega,
quruumuhu waxay isaga la yihiin sida dhibic biyeed oo baaldi
ku jirta oo kale, oo wuxuu ku xisaabaa sida boodh kafado dul
saaran oo kale, oo bal eega, gasiiradahana wuxuu kor ugu
qaadaa sida habaas fudud oo kale. 16 Oo Lubnaan in la gubo
kuma filla, oo xayawaankeedana qurbaan la gubo uguma
filla. 17 Quruumaha oo dhammu waxay hortiisa ku yihiin sida
wax aan jirin oo kale, oo waxay isaga la xisaabsan yihiin wax
ka sii yar baabba' iyo waxaan waxba ahayn. 18 Haddaba bal
yaad Ilaah u ekaysiinaysaan? Amase masaalkee baad isaga
kala mid dhigaysaan? 19 Ninkii saanac ahu sanam xardhan
buu shubaa, oo dahabtumuhuna dahab buu ku dahaadhaa,
oo wuxuu u tumaa silsilado lacag ah. 20 Kii miskiin ah oo
aan qurbaan awoodi karinuse wuxuu doortaa geed aan bololi
karin, oo wuxuu doondoontaa nin saanac ah oo hagaajiya
sanam xardhan oo aan dhaqaaqi karin. 21 Miyeydaan
ogayn? Miyeydaan maqlin? Miyaan bilowgii laydiin sheegin?
Oo miyeydaan garan tan iyo aasaaskii dhulka? 22 Waa isaga
kan wareegga dhulka dul fadhiya, oo dadka kor degganuna
waa sida kabajaan oo kale, oo waa isaga kan samooyinka
sida daah u kala fidiya, oo wuxuu u kala bixiyaa sida teendho
lagu hoydo oo kale. 23 Isagu amiirrada wuxuu ka dhigaa sida
wax aan jirin oo kale, oo xaakinnada dhulkana wuxuu ka
dhigaa sida wax aan waxba ahayn oo kale. 24 Hubaal iyaga
lama beerin, lamana abuurin, jirriddooduna dhulka xidid
kuma yeelan, weliba wuu afuufaa, oo iyana way engegaan,
oo dabaysha cirwareenta ah ayaa iyaga sida xaab oo kale u
qaada. 25 Haddaba kan Quduuska ahu wuxuu leeyahay,
Bal yaad ii ekaysiinaysaan si aan ula mid noqdo? 26 Bal
indhihiinna kor u qaada oo eega. Yaa waxyaalahaas uumay?
Waa kan ciidankooda tirada ku soo bixiya, oo kulligoodba
magacyo ugu yeedha. Itaalkiisu wuu weyn yahay oo isagu
wuu xoog badan yahay, oo sidaas daraaddeed midkoodna
ma dhinna. 27 Reer Yacquubow, bal maxaad u leedahay,
Reer binu Israa'iilow, bal maxaad ugu hadlaysaa, Jidkaygu
Rabbiga wuu ka qarsoon yahay, oo Ilaahayna gartayda
dan kama galo? 28 War miyaadan ogayn? Oo miyaadan
maqlin in Ilaaha daa'imka ah oo ah Rabbiga ah Uumaha
dhulka darafyadiisa uusan itaal darnaan ama uusan daalin?
Waxgarashadiisana lama baadhi karo. 29 Isagu kuwa itaalka
daran xoog buu siiyaa, oo kuwa aan tabarta lahaynna tabar
buu u kordhiyaa. 30 Xataa dhallinyaradu way itaal darnaan

doonaan, oo daali doonaan, oo barbaarraduna aad bay u
dhici doonaan. **31** Laakiinse kuwa Rabbiga isku halleeyaa
xoog cusub bay heli doonaan. Way ordi doonaan, mana
ay daali doonaan, oo way socon doonaan, mana ay itaal
darnaan doonaan.

**41** Gasiiradahow, hortayda ku aamusa, oo dadkuna
xooggooda ha cusboonaysiisteen, ha soo dhowaadeen,
oo ha hadleen. Aynu dhammaanteen garsoorid u soo wada
dhowaanno. **2** Waa kuma kan mid xagga bari ka soo kiciyey,
oo isaga xaqnimo ugu yeedhay inuu raaco? Quruumaha
hortiisuu ku siiyaa, oo isaga ka dhigaa inuu boqorro u
taliyo. Iyaga wuxuu seeftiisa kaga dhigaa sida boodh oo
kale, oo qaansadiisana wuxuu kaga dhigaa sida xaab
bidaya oo kale. **3** Isagu wuu eryadaa iyaga, oo ammaan
buu ku dhaafaa jid uusan mar hore marin. **4** Yaa waxan
sameeyey oo sidan yeelay isagoo facaca bilowgii uga
yeedhaya? Anigoo Rabbiga ah, oo ah Kan ugu horreeya
iyo Kan kuwa dambe la jira, isagaan ahay. **5** Gasiiradahu
way arkeen, wayna cabsadeen, oo dhulka darafyadiisuna
way gariireen, wayna soo dhowaadeen oo yimaadeen. **6**
Midkood waluba wuxuu caawiyey deriskiisii, oo midkood
waluba wuxuu walaalkiis ku yidhi, Dhiirranow. **7** Markaasuu
nijaarkii dahabtumihii dhiirrigeliyey, oo kii dubbaha wax
ku simi jirayna birtumihii buu dhiirrigeliyey, isagoo leh,
Laxaamaddu way wanaagsan tahay. Markaasuu masaamiir
ku sii adkeeyey si ayan u dhaqdhaqaaqin. **8** Laakiinse
reer binu Israa'iilow, waxaad tihiin addoommadayda, reer
Yacquubkii aan doortayow, farcankii saaxiibkay Ibraahimow,
**9** waxaan idinka soo kaxaystay dhulka darafyadiisa, oo
geesihiisa waan idiinka yeedhay, oo waxaan idinku idhi,
Waxaad tihiin addoommadayda, waanan idin doortay,
idinmana xoorin. **10** Ha cabsanina, waayo, waan idinla jiraa,
ha nixina, maxaa yeelay, Ilaahiinna baan ahay, waan idin
xoogayn doonaa, waanan idin caawin doonaa, oo waxaan
idinku tiirin doonaa midigtayda xaqa ah. **11** Bal eega, kuwa
idinku cadhaysan oo dhammu way wada ceeboobi doonaan,
wayna sharafjabi doonaan, oo kuwa idinla dirirayaana
waxay noqon doonaan sida wax aan jirin, wayna wada
halligmi doonaan. **12** Waad doondooni doontaan, mana
aad heli doontaan, xataa kuwa idinla diriraya, kuwa idinla
dagaallamayaana waxay noqon doonaan sida wax aan jirin
oo kale, iyo sida wax baabbah ah. **13** Waayo, anigoo ah
Rabbiga Ilaahiinna ah ayaa gacanta midig idinku qaban
doona anoo idinku leh, Ha cabsanina, anigaa idin caawin
doone. **14** Dixiriga reer Yacquub ahow, ha cabsan, dadkiinnan
reer binu Israa'iilow, waan idin caawin doonaa, ayuu leeyahay
Rabbiga Bixiyihiinna ah oo ah Kan Quduuska ah ee reer
binu Israa'iil. **15** Bal eega, waxaan idinka dhigi doonaa
alaab cusub oo af badan oo ilka leh oo wax lagu tumo, oo
waxaad tumi doontaan buuraha, waanad daqiijin doontaan,
oo kurahana waxaad ka dhigi doontaa sida buunshe oo
kale. **16** Waad haadin doontaan, oo dabayshaa kaxaysan
doonta, cirwareentuna way kala firdhin doontaa, oo waxaad
ku rayrayn doontaan Rabbiga, waanad ku faani doontaan
kan Quduuska ah ee reer binu Israa'iil. **17** Masaakiinta
iyo saboolka baahanuba biyay doondoonaan, mana jiraan,
carrabkoodiina oon buu la engegay, anigoo Rabbiga ah
ayaa u jawaabi doona, anigoo ah Ilaaha reer binu Israa'iil
ma dayrin doono. **18** Meelaha sarsare ayaan webiyo ka
furi doonaa, ilona dhooxooyinka dhexdood ayaan ka soo
dayn doonaa. Oo cidladana waxaan ka dhigi doonaa balli
biya ah, dhulka engeganna durdurro biya ah. **19** Waxaan
cidlada ku soo beeri doonaa geedaha la yidhaahdo kedar,
iyo qudhac, iyo hadaas, iyo geedsaliid, oo lamadegaankana
waxaan ka soo bixin doonaa geedaha ah beroosh, iyo
tidhaar, iyo te'ashuur, **20** in la arko, oo la ogaado, oo laga
fiirsado, oo dhammaan la wada garto in gacanta Rabbigu ay
waxaas samaysay, iyo in kan Quduuska ah oo reer binu
Israa'iil uu waxaas uumay. **21** Rabbigu wuxuu leeyahay,
Dacwadiinna keena. Boqorka reer Yacquub wuxuu leeyahay,
Sababihiinna adag soo saara. **22** Iyagu ha soo saareen, oo
waxa dhici doona ha noo sheegeen. Waxyaalihii jiri jiray iyo
waxay yihiin noo sheega, si aannu uga fiirsanno, oo aannu u
ogaanno waxay ugudambaystoodu noqon doonto, amase
waxyaalaha iman doona na tusa. **23** Waxyaalaha hadda
dabadeed iman doona noo sheega si aannu u ogaanno
inaad idinku ilaahyo tihiin. Bal wanaag ama shar sameeya,
si aannu u naxno, oo aannu dhammaantayo u wada fiirinno.
**24** Bal eega, idinku waxaad tihiin sida waxaan jirin oo kale,
oo shuqulkiinnuna waa baabba', oo kii idin doortaana waa
karaahiyo. **25** Mid baan xagga woqooyi ka soo kiciyey,
wuuna yimid, kaasoo tan iyo marka qorraxdu soo baxdo
magacayga ku baryootama, oo wuxuu amiirro ugu dul tuman
doonaa sida dhoobada malaasta ah loogu tunto oo kale, iyo
sida dheryasameeyuhu dhoobada ugu tunto oo kale. **26**
Kumaase waa hore sii sheegay, si aannu u nidhaahno, Waa
runtiis? Hubaal mid wax sheega ma jiro, oo mid wax tusa
ma jiro, oo mid erayadiinna maqla ma jiro. **27** Anaa ah Kan
ugu horreeya oo Siyoon ku yidhi, Bal eega, bal eega iyaga,
oo waxaan Yeruusaalem siin doonaa mid war wanaagsan u
keena. **28** Oo markaan eego, ninna ma jiro, oo markaan
wax weyddiiyana taliye eray iigu jawaabi kara dhexdooda
laguma arag. **29** Bal eega, kulligood shuqulladoodu waa wax

aan waxba ahayn, waana baabba' oo sanamyadooda la
shubayna waa dabayl iyo wax aan micne lahayn.

**42** Bal eega addoonkayga aan tiiriyo, oo aan doortay oo
ay naftaydu ku faraxsan tahay. Ruuxayga ayaan dul
saaray. Wuxuu quruumaha u soo saari doonaa xukunka.
**2** Ma uu qaylin doono, korna uma dhawaaqi doono, oo
codkiisana kama uu dhigi doono in jidadka laga maqlo. **3**
Cawsduur nabar leh ma jebin doono, dubaalad qiiqaysana
ma demin doono, xukunkuu runta ku soo saari doonaa. **4**
Isagu ma uu taag darnaan doono, mana uu qalbi jabi doono,
jeeruu caddaalad dhulka ku hagaajiyo, oo gasiiraduhuna
waxay sugi doonaan sharcigiisa. **5** Saas waxaa leh Ilaaha
Rabbiga ah oo samooyinka uumay oo kala bixiyey, kan
dhulka iyo waxa ka soo baxaba kala fidiyey, kan dadka
jooga neefta siiya, oo kuwa dhulka ku socdana ruuxa siiya.
**6** Aniga Rabbiga ah ayaa xaqnimo kuugu yeedhay, oo
gacantaan kugu hayn doonaa, oo waan ku dhawri doonaa,
oo dadyowga ayaan axdi ahaan kuu siin doonaa, oo iftiin
ahaan baan quruumaha kuu siin doonaa, **7** inaad kuwa
indhaha la' indhaha u furtid, iyo inaad maxaabiista xabsiga
ka soo bixisid, iyo inaad kuwa gudcurka fadhiya ka soo
bixisid guriga xabsiga. **8** Anigu waxaan ahay Rabbiga,
kaasuna waa magacayga, oo sharaftaydana mid kale ma
siin doono, oo ammaantaydana sanamyo xardhan innaba
ma siin doono. **9** Bal eega, waxyaalihii hore way wada
noqdeen, oo hadda waxaan idiin sheegayaa waxyaalo cusub,
oo intayan iman ayaan idiin sii sheegayaa. **10** Kuwiinna
badda ku sii dhaadhacayow, iyo waxa dhexdeeda ku jira oo
dhammow, gasiiradaha iyo kuwa degganow, Rabbiga hees
cusub ugu heesa, oo ammaantiisana dhulka darafkiisa ka
qaada. **11** Cidlada iyo magaalooyinkeeda iyo tuulooyinka ay
reer Qedaar deggan yihiinba, codkooda kor ha u qaadeen,
kuwa Selac degganu ha heeseen, oo buuraha dushooda ha
ka qayliyeen. **12** Rabbiga ha sharfeen, oo ammaantiisana
gasiiradaha ha ka naadiyeen. **13** Rabbigu wuxuu u soo bixi
doonaa sida nin xoog badan, oo qiirona wuxuu u soo kicin
doonaa sida nin dagaalyahan ah. Wuu qaylin doonaa, oo
aad buu u dhawaaqi doonaa, oo xoog buuna cadowyadiisa
kaga adkaan doonaa. **14** Wakhti dheer baan iska aamusnaa
oo aan xasilloonaa oo aan iscelinayay, oo haatan waxaan u
qaylin doonaa sida naag foolanaysa oo kale, waan hinraagi
doonaa, waanan taahi doonaa. **15** Waxaan baabbi'in doonaa
buuro iyo kuro, oo geedaha yaryar oo dhanna waan wada
qallajin doonaa, oo durdurradana waxaan ka dhigi doonaa
gasiirado, oo balliyadana waan engejin doonaa. **16** Oo
kuwa indhaha la'na waxaan soo marsiin doonaa jid ayan
mar hore aqoon, oo waxaan ku hagi doonaa dhabbayaal
ayan aqoon, oo gudcurkana waxaan hortooda kaga dhigi
doonaa iftiin, oo meelaha qalloocanna waan u toosin doonaa.
Waxyaalahaas baan samayn doonaa, oo innaba iyaga ma
dayrin doono. **17** Kuwa sanamyada xardhan isku halleeya, oo
sanamyada la shubay ku yidhaahda, Idinku ilaahyadayada
baad tihiin, dib baa loo sii jeedin doonaa, oo aad loo ceebayn
doonaa. **18** Kuwiinna dhegaha la'ow, wax maqla, oo kuwiinna
indhaha la'ow, wax fiiriya, aad wax aragteene. **19** Bal yaa
indha la' addoonkayga mooyaane? Yaase dhega la' sida
wargeeyahayga aan soo diray? Yaase indha la' sida kan ila
nabdoon, iyo sida addoonka Rabbiga? **20** Waxyaalo badan
baad aragtaa, laakiinse uma fiirsatid, dhegaha waa la furay,
laakiinse waxba lama maqlo. **21** Rabbigu wuxuu aad ugu
farxay xaqnimadiisa aawadeed inuu sharciga weyneeyo
oo aad u sharfo. **22** Laakiinse kuwanu waa dad la dhacay
oo la boobay, oo kulligoodna waxaa lagu dabay godad,
oo waxaa lagu qariyey guryo xabbiseed, iyagu waa wax
la ugaadhsado, oo ninna ma samatabbixiyo, waa wax la
boobo oo ciduna ma tidhaahdo, soo celiya. **23** Bal yaa
idinka mid ah oo waxan dhegta u dhigi doona? Bal yaa
dib dambe u dhegaysan oo maqli doona? **24** Bal yaa reer
Yacquub ka dhigay in la boobo, yaase reer binu Israa'iil
tuugagga u gacangeliyey? Sow ma aha Rabbiga, kan aynu
ku dembaabnay oo ay diideen inay jidadkiisa ku socdaan, oo
ay sharcigiisana addeeci waayeen? **25** Sidaas daraaddeed
wuxuu dadka ku sii daayay cadhadiisii aad u kululayd, iyo
xooggii dagaalka, oo hareerahooda oo dhanna dab baa
lagu shiday, laakiinse way garan waayeen, waana la gubay,
illowse innaba qalbiga ma gelin.

**43** Laakiinse haatan, reer Yacquubow, Rabbigii idin uumay
wuxuu leeyahay, oo reer binu Israa'iilow, kii idin
sameeyey wuxuu leeyahay, Ha cabsanina, waayo, anigaa
idin soo furtay, oo magiciinna idiin bixiyey, oo kuwayga
baad tihiin. **2** Markaad biyaha dhex maraysaan waan idinla
jiri doonaa, oo markaad webiyaasha dhex qaadaysaanna
idinma qarqin doonaan, markaad dabka ku dhex socotaanna,
ma guban doontaan, ololkuna idinma qabsan doono. **3**
Waayo, waxaan ahay Rabbiga Ilaahiinna ah oo ah Kan
Quduuska ah ee reer binu Israa'iil iyo Badbaadiyihiinna.
Masar baan furashadiinnii u bixiyey, oo Itoobiya iyo Sebaana
beddelkiinnii. **4** Indhahayga hortooda waxaad ku ahaydeen
kuwa qaali ah, oo sharaf badan, waanan idin jeclaaday, oo
sidaas daraaddeed niman baan idinku doorsan doonaa, oo
dad badan baan naftiinna ku soo beddelan doonaa. **5** Ha
cabsanina, waayo, waan idinla jiraa, oo farcankiinnana xagga

bari baan ka keeni doonaa, oo xagga galbeed baan idinka
soo ururin doonaa, 6 oo waxaan woqooyi ku odhan doonaa,
Soo daa, oo koonfurna waxaan ku odhan doonaa, Ha celin,
wiilashayda meel fog ka soo kexee, oo gabdhahaygana
dhulka darafkiisa ka soo kexee, 7 waana mid kasta oo
magacayga loogu yeedho, oo aan u uumay sharaftayda
aawadeed. Anigaa sameeyey, oo anigaa suubbiyey. 8
Waxaad soo bixisaan dadka indhaha la' oo indho leh, iyo
kuwa dhegaha la' oo dhego leh. 9 Quruumaha oo dhammu
ha isu soo wada urureen, oo dadyowguna ha soo wada
shireen. Bal yaa iyaga ka mid ah oo waxan sheegi kara
oo waxyaalihii hore noo sheegi kara? Markhaatiyaashoodii
ha keenteen si ay xaq ku noqdaan aawadeed, amase ha
maqleen oo ha yidhaahdeen, Taasu waa run. 10 Rabbigu
wuxuu leeyahay, Idinka iyo addoonkaygii aan doortayba
markhaatiyaashaydii baad tihiin inaad ogaataan oo aad
i rumaysataan, oo aad garataan inaan anigu isagii ahay.
Aniga hortay Ilaah lama samayn, dabadayna innaba ma jiri
doono. 11 Aniga, aniga qudhayda ayaa Rabbiga ah, oo aniga
mooyaane Badbaadiye kale ma jiro. 12 Anigu waan naadiyey,
oo waan badbaadiyey, oo waan muujiyey, oo ilaah qalaad
dhexdiinna kuma uu jirin, haddaba sidaas daraaddeed
idinku waxaad tihiin markhaatiyaashaydii, ayaa Rabbigu
leeyahay. Aniguna Ilaah baan ahay. 13 Tan iyo maalintii
ugu horraysay anigu waxaan ahay isagii, oo mana jiro mid
gacantayda wax ka samatabbixin kara, anigu waan shaqayn
doonaa, balse yaa hor joogsan kara? 14 Rabbiga Bixiyihiinna
ah oo ah Kan Quduuska ah ee reer binu Israa'iil wuxuu
leeyahay, Idinka aawadiin ayaan Baabuloon ugu cid diray, oo
kuweedii cararay oo dhanna, kuwaasoo ahaa reer Kaldayiin,
waxaan ku keeni doonaa doonniyaha ay ku faani jireen.
15 Anigu waxaan ahay Rabbiga ah Kiinna Quduuska ah,
iyo Abuuraha reer binu Israa'iil, iyo Boqorkiinna. 16 Sidaas
waxaa leh Rabbiga badda dhexdeeda jid ka sameeya, oo
biyaha xoogga badan dhexdoodana dhabbe ka hagaajiya,
17 kan gaadhifaraska iyo faraska, iyo ciidanka iyo ninka
xoogga badan soo bixiya, iyagu dhammaantood way wada
jiifsadaan, oo mana ay kici doonaan, way bakhtiyeen, oo
waxay u dameen sidii dubaalad oo kale. 18 Waxyaalihii
hore ha xusuusanina, waxyaalihii qadiimka ahaana ha ka
fikirina. 19 Bal eega, wax cusub baan samaynayaaye, oo
haddeer bay soo baxayaan, idinku miyeydaan garan doonin?
Xataa cidlada dhexdeeda jid baan ka samayn doonaa, oo
lamadegaanka dhexdiisana webiyo baan ka jeexi doonaa.
20 Xayawaanka duurka, kuwaasoo ah dawacooyinka iyo
gorayaduba way i sharfi doonaan; maxaa yeelay, cidladaan
biyo uga siiyaa, oo lamadegaankaan webiyo uga jeexaa si
aan u waraabiyo dadkayga aan doortay, 21 oo ah dadkaan
abuurtay si ay ammaantayda u muujiyaan. 22 Laakiinse
reer Yacquubow, ima aydaan baryin, reer Israa'iilow, waad
iga daasheen. 23 Adhigiinnii qurbaannadiinna la gubo
iiguma aydaan keenin, oo allabaryadiinniina iguma aydaan
sharfin. Anigu idinkuma aanan dhibin inaad qurbaanno ii
bixisaan, oo idinkumana aanan daalin inaad foox ii shiddaan.
24 Qasab macaan lacag iiguma aydaan soo iibin, oo
baruurtii allabaryadiinnana igama aydaan dherjin, laakiinse
waxaad aad iigu dhibteen dembiyadiinnii, oo waxaad igu
daaliseen xumaatooyinkiinnii. 25 Aniga qudhayda weeye
kan xadgudubyadiinna tirtira, aawaday baan u tirtiraa, oo
dembiyadiinnana sooma aan xusuusan doono. 26 Bal wax
i soo xusuusiya, aynu isla muddacnee, dacwadiinna soo
caddeeya, si aad xaq ku noqotaan. 27 Awowgiinnii hore
wuu dembaabay, oo macallimiintiiniina way igu xadgudbeen.
28 Haddaba sidaas daraaddeed waxaan amiirradii meesha
quduuska ah ka dhigi doonaa wax nijaas ah, reer Yacquubna
habaar baan u dayn doonaa, oo dadka Israa'iilna cay baan u
dayn doonaa.

44 Haddaba addoommadayda reer Yacquubow, iyo dadka
Israa'iil ee aan doortayow, bal i maqla. 2 Rabbiga
idin uumay, oo tan iyo markaad uurka ku jirteen idin
samaynayay, oo haddana ku caawin doona wuxuu leeyahay,
Addoommadayda reer Yacquubow, iyo Yeshuruunkii aan
doortayow, ha cabsanina. 3 Waayo, kii oomman biyaan
ku shubi doonaa. Ruuxayga ayaan farcankiinna ku daadin
doonaa, oo barakadaydana carruurtiinnaan ku shubi doonaa.
4 Oo iyana waxay ka soo dhex bixi doonaan cawska sida
geedo safsaaf ah oo biyo socda ku ag yaal. 5 Oo midba
wuxuu odhan doonaa, Anigu waxaan ahay kii Rabbiga, oo
mid kalena wuxuu isu bixin doonaa magicii Yacquub, oo
mid kalena wuxuu gacantiisa ku kor qori doonaa, Waxaan
ahay kii Rabbiga, oo wuxuu isku magacaabi doonaa magicii
Israa'iil. 6 Rabbiga ah Boqorka iyo Bixiyaha reer binu Israa'iil
oo ah Rabbiga ciidammadu wuxuu leeyahay, Anigu waxaan
ahay kan ugu horreeyey iyo kan ugu dambeeya, oo aniga
mooyaane Ilaah kale ma jiro. 7 Bal yaa sidayda oo kale u
sheegi kara? Ha naadiyo, oo si hagaagsan ha iigu sheegeen
anoo dadkii hore dhisay. Oo waxyaalaha soo socda iyo waxa
dhici doona iyagu ha sii sheegeen. 8 Ha cabsanina oo ha
baqina, waayo, miyaanan waa hore idiin sii sheegin, oo
aanan idin tusin? Idinku waxaad tihiin markhaatiyaashaydii.
Aniga mooyaane ma Ilaah kalaa jira? Hubaal Dhagax kale
ma jiro. Innaba mid kale garan maayo. 9 Sanamyada la qoray
kuwa sameeya oo dhammu waa wax aan waxba tarayn, oo

waxyaalaha ay jeclaadaanna faa'iido ma yeelan doonaan,
oo markhaatiyaashooduna waxba ma arkaan, waxna ma
oga, saas darteed way ceeboobi doonaan. **10** Bal yaa wax
ilaah ah sameeyey, amase shubay sanam xardhan oo aan
waxba tarayn? **11** Bal eega, kuwa daba gala oo dhammu
way wada ceeboobi doonaan, saanacyadu waa binu-aadmi
uun. Bal dhammaantood ha isu soo wada urureen, oo ha
soo istaageen, way cabsan doonaan, oo kulligoodna way
wada ceeboobi doonaan. **12** Birtumuhu faas buu sameeyaa
oo wuxuu ku shaqeeyaa dhuxul, oo dubbayaal buu ku
qabanqaabiyaa, oo gacantiisa xoogga badan ayuu kaga
shaqeeyaa; wuu gaajoodaa, wuuna taag gabaa, biyo ma
cabbo, wuuna daalaa. **13** Nijaarku xadhig wax lagu qiyaaso
buu fidiyaa, oo wax cas buu ku calaamadeeyaa, oo faaraduu
ku simaa, oo goobeeyena wuu ku qiyaasaa, oo wuxuu u
ekaysiiyaa binu-aadmiga ekaantiis iyo si waafaqsan dadka
quruxdiisa inuu guriga joogo. **14** Wuxuu soo goostaa geedo
kedar ah, oo wuxuu soo qaataa geed tirsah ah iyo geed
alloon ah, oo mid ka mid ah dhirta duudda ayuu xoogaystaa,
oo wuxuu beertaa geed oren ah oo roobkuna waa quudiyaa.
**15** Dabadeedna wuxuu noqon doonaa wax dad shito, waayo,
wax buu ka qaadaa, oo wuu kulaalaa, wuuna shitaa oo kibis
buu ku dubtaa, oo weliba wax ilaah ah buu ka samaystaa,
wuuna u sujuudaa. **16** Oo in buu dabka ku gubaa, oo inna
hilib buu ku bislaystaa, isagoo ku sosha oo ka dherga, wuuna
kulaalaa oo wuxuu yidhaahdaa, Hadda waan kululahay,
oo dabkii waan arkay. **17** Oo intii ka hadhana wuxuu ka
samaystaa wax ilaah ah oo ah xataa sanamkiisa xardhan,
oo wuu u sujuudaa oo caabudaa, wuuna baryaa, oo wuxuu
yidhaahdaa, I samatabbixi, waayo, adigu waxaad tahay
ilaahayga. **18** Iyagu ma ay aqoon, mana ay garanayn,
waayo, indhahoodii waa la xidhay si ayan waxba u arkin,
oo qalbigoodiina si ayan waxba u garan. **19** Oo midkoodna
kama fikiro, oo aqoon iyo waxgarasho midna laguma arko,
inuu yidhaahdo, Qoriga qaarkiis baan dab ku gubay, oo
duxushiisaan kibis ku dubtay, oo hilib baan ku soshay,
waanan cunay, haddaba ma intii ka hadhay baan karaahiyo
ka samaystaa? Ma waxaan u sujuudaa geed jiriddiis? **20**
Isagu wuxuu cunaa dambas, oo qalbigiisa la khiyaaneeyey
ayaa isaga leexiyey, oo naftiisana ma uu samatabbixin
karo, mana uu odhan karo, Sow gacantayda midig beenu
kuma jirto? **21** Reer Yacquubow, waxyaalahan xusuusta,
waayo, reer Israa'iilow, waxaad tihiin addoommadayda.
Anigaa idin abuuray, oo waxaad tihiin addoommadayda.
Israa'iilow, idin illoobi maayo. **22** Sidii daruur qaro weyn
ayaan xadgudubyadiinnii u tirtiray, oo sidii daruur oo kale
ayaan dembiyadiinniina u tirtiray. Haddaba ii soo noqda,
waayo, waan idin soo furtay. **23** Samooyinkow, heesa, waayo,
Rabbigaa sameeyey. Dhulka meelaha ugu hooseeyow,
qayliya. Buuraha, iyo duudda, iyo geed kasta oo ku dhex
yaallow, hees ku dhufta, waayo, Rabbigu reer Yacquub wuu
soo furtay oo wuxuu isku dhex weynayn doonaa reer binu
Israa'iil. **24** Rabbiga ah Samatabbixiyihiinna iyo kii tan iyo
markaad uurka ku jirteen idin samaynayay wuxuu leeyahay,
Waxaan ahay Rabbiga wax kasta sameeya, oo keligiis
samooyinka kala bixiya, oo keligiisna dhulka kala fidiya. **25**
Anigu waxaan ahay kan calaamadaha beenlowyada wax
aan waxba ahayn ka dhiga, oo kuwa wax falana nacasyo ka
dhiga, oo kuwa caqliga lehna dib u celiya, oo aqoontoodana
nacasnimo ka dhiga, **26** kan erayga addoonkiisa xaqiijiya,
oo talada wargeeyayaashiisa oofiya, kan Yeruusaalem ka
leh, Iyada waa la dhex degi doonaa, oo magaalooyinka
dalka Yahuudahna ka leh, Iyaga waa la dhisi doonaa, oo
burburkoodana waan sara kicin doonaa. **27** Waxaan ahay kan
moolka ku yidhaahda, Engeg noqo, oo anna webiyaashaada
waan qallajin doonaa, **28** kan Boqor Kuuros ka leh, Isagu
waa adhijirkayga, oo wuxuu oofin doonaa waxaan jeclahay
oo dhan, oo xataa Yeruusaalemna ka leh, Iyada waa la dhisi
doonaa, oo macbudkana ku leh, Aasaaskaaga waa la dhigi
doonaa.

**45** Rabbigu wuxuu ku leeyahay kan uu subkaday oo ah
Kuuros, oo uu gacantiisa midig hayay inuu hortiisa
quruumo ku hoosaysiiyo, oo uu boqorro dhexdooda guntiga
ka furo, inuu hortiisa albaabbada ka furo, albaabbadaasna
aanay mar dambe xidhmin: **2** Anigu waan ku hor socon
doonaa, oo meelaha sarsarena waan simi doonaa, waanan
kala burburin doonaa albaabbada naxaasta ah, oo qataarrada
birta ahna waan kala googooyn doonaa, **3** oo waxaan ku siin
doonaa khasnadaha gudcurka iyo maal qarsoon oo meelo sir
ah ku jira, inaad ogaatid inaan ahay Rabbiga ah Ilaaha reer
binu Israa'iil oo magacaa kuugu yeedha. **4** Addoonkaygii
Yacquub oo ah Israa'iilkii aan doortay daraaddiis ayaan
magacaa kuugu yeedhay, waanan ku magacaabay in kastoo
aadan i aqoon. **5** Waxaan ahay Rabbiga, oo mid kale ma
jiro, aniga mooyaane Ilaah kale ma jiro. Anigaa guntiga kuu
xidhay in kastoo aadan i aqoon, **6** in qorrax ka soo bax iyo
galbeedba laga ogaado inaan aniga mooyaane mid kale jirin.
Anigaa Rabbiga ah, mid kalena ma jiro. **7** Iftiinka anigaa
sameeya, oo masiibadana anigaa abuura. Anigoo Rabbiga
ah ayaa waxyaalahan oo dhan sameeya. **8** Samooyinkow,
xagga sare ka soo tiftifqa, oo daruuruhuna xaqnimo ha
soo shubeen, dhulkuna ha furmo, oo badbaadada iyo
xaqnimaduna ha isla soo wada baxaan. Aniga Rabbiga ah
ayaa uumay. **9** Waxaa iska hoogay ka Uumihiisa la dirira!

Wuxuu la mid yahay dheri jabkiis oo ka mid ah jajabka
dhulka! Dhoobadu miyey kan sameeya ku tidhaahdaa,
War maxaad samaynaysaa? Amase shuqulkaaguu miyuu
yidhaahdaa, Gacmo ma leh? 10 Waxaa iska hoogay kii aabbe
ku yidhaahda, War maxaad dhalaysaa? Amase naag ku
yidhaahda, Na maxaad ku foolanaysaa? 11 Rabbiga ah Kan
Quduuska ah ee reer binu Israa'iil, oo ah Uumihiisu wuxuu
leeyahay, Waxyaalaha iman doona ma i weyddiinaysaan, oo
wax ku saabsan wiilashayda, iyo shuqulka gacmahayga ma
igu amraysaan? 12 Dhulka anigaa abuuray, oo dad baan ku
dul uumay. Aniga qudhayda ayaa samooyinka gacmahayga
ku kala bixiyey, oo ciidankooda oo dhanna anigaa amray. 13
Rabbiga ciidammadu wuxuu leeyahay, Boqor Kuuros ayaan
xaqnimo ku sara kiciyey, oo jidadkiisa oo dhanna waan toosin
doonaa. Magaaladayduu dhisi doonaa, oo maxaabiistaydana
wuu sii dayn doonaa, mana aha iib aawadiis amase laaluush
aawadiis toona. 14 Rabbigu wuxuu leeyahay, Hawsha Masar,
iyo baayacmushtariga Itoobiya, iyo reer Saabaa'iim oo ah dad
sarajoog dheer idinkay idiin soo gudbi doonaan, oo kuwiinnay
ahaan doonaan. Iyagu way idin daba socon doonaan,
oo waxay idiin soo gudbi doonaan iyagoo silsiladaysan,
oo way idiin sujuudi doonaan, wayna idin baryi doonaan,
iyagoo leh, Sida xaqiiqada ah Ilaah dhexdiinnu jiraa, oo mid
kalena ma jiro, oo isaga mooyaane Ilaah kale ma jiro. 15
Ilaaha reer binu Israa'iil oo ah Badbaadiyahow, sida runta
ah waxaad tahay Ilaah isqariya. 16 Iyagu dhammaantood
way ceeboobi doonaan oo giddigoodna way sharafjabi
doonaan, oo kuwa sanamyo sameeya oo dhammu way
wada qasmi doonaan. 17 Laakiinse Rabbigu wuxuu reer binu
Israa'iil ku badbaadin doonaa badbaado daa'im ah, oo idinku
weligiin iyo weligiinba ma aad ceeboobi doontaan, mana
aad sharafjabi doontaan. 18 Waayo, Rabbiga samooyinka
uumay oo ah Ilaaha dhulka uumay, oo sameeyey, oo dhisay,
oo aan si aan waxba tarayn u uumin, laakiinse u uumay in
la degganaado wuxuu leeyahay, Anigaa Rabbiga ah mid
kalena ma jiro. 19 Anigu kuma hadlin qarsoodi iyo meel
gudcur ah oo dhulka ka mid ah. Farcanka Yacquub kuma
odhan, Si aan waxba tarin ii doondoona. Aniga Rabbiga ahu
waxaan ku hadlaa xaqnimo, oo waxaan sheegaa waxyaalo
qumman. 20 Kuwiinna quruumaha ka baxsadayow, soo shira,
oo dhammaantiin kaalaya, kulligiin soo wada dhowaada.
Kuwa sanamyadooda qoriga ah sita oo ilaah aan waxba
badbaadin karin barya aqoon ma leh. 21 Sheega oo soo
saara, iyagu ha isla wada tashadeen. Bal yaa waxyaalahan
waa hore muujiyey? Oo bal yaa wakhti hore sii sheegay?
Sow ma aha aniga Rabbiga ah? Oo aniga mooyaane Ilaah
kale ma jiro. Waxaan ahay Ilaah xaq iyo Badbaadiye ah, oo
aniga mooyaane mid kale ma jiro. 22 Dhulka darafyadiisa oo
dhammow, i soo eega, oo kulligiin badbaada, waayo, anigaa
Ilaah ah, oo aniga mooyaane mid kale ma jiro. 23 Waxaan
ku dhaartay nafsaddayda, oo eray baa afkayga xaqnimo uga
baxay, soona noqon maayo, waxaana weeye, Jilib waluba
anuu ii sujuudi doonaa, carrab walubana waa igu dhaaran
doonaa. 24 Waxaa laygu odhan doonaa, Rabbiga uun ayaa
xaqnimo iyo xoogba leh. Isagaa loo iman doonaa, oo kuwii
isaga u cadhaysnaa oo dhammuna way wada ceeboobi
doonaan. 25 Farcanka Israa'iil oo dhammu Rabbiga bay xaq
ku noqon doonaan, wayna faani doonaan.

**46** Beel baa foororsada, Nebona wuu dhacaa,
sanamyadoodu waxay kor saarnaadaan xayawaanka
iyo lo'da. Waxyaalihii aad sidan jirteen waxaa laga dhigay
rar la saaray neefkii daallanaa. 2 Way foororsadaan,
oo dhammaantood way wada dhacaan, iyagu rarka ma
ay samatabbixin karaan, laakiinse xataa iyaga qudhooda
maxaabbiisahaan baa loo kaxaystaa. 3 Reer Yacquub
oo ah kuwa reer binu Israa'iil ka hadhay oo dhammow,
kuwiinna aan siday tan iyo wakhtigii aad caloosha ku jirteen
oo aan xambaaray tan iyo wakhtigii aad uurka ka soo
baxdeen, i maqla. 4 Tan iyo cimri dheer isagii baan ahay,
oo tan iyo timo cirroobay waan idin xambaarayaa. Anigaa
sameeyey, waanan sidi doonaa, waan xambaari doonaa,
waanan samatabbixin doonaa. 5 Bal yaad ii ekaysiinaysaan
oo ila simaysaan, oo yaad igu masaalaysaan inaannu isku
mid ahaanno? 6 Kuwa dahab kolayga ka soo qubaa, oo
lacagna kafadaha ku miisaamaa waxay soo kiraystaan
dahabtume, oo isna wax ilaah ah buu ka dhigaa, markaasay
u sujuudaan oo caabudaan. 7 Garbahooday ku qaadaan,
oo way xambaaraan, oo meeshiisay qotomiyaan. Isna wuu
iska taagnaadaa, oo meeshiisana innaba kama dhaqaaqo.
Oo dadku way u qayshan doonaa, laakiinse isagu uma uu
jawaabi karo, oo dhibkoodana kama uu badbaadin karo. 8
Kuwiinna xadgudbayow, bal waxan soo xusuusta, oo aad u
fiirsada, bal mar kale soo garwaaqsada. 9 Bal waxyaalihii
hore oo qadiimka ahaa soo xusuusta, waayo, anigaa Ilaah
ah, mid kalena ma jiro, anigaa Ilaah ah, oo mid ila mid ahuna
ma jiro. 10 Bilowga waxaan sheegaa ugudambaysta, oo
wakhtiga hore waxaan sii sheegaa waxyaalo aan weli la
samayn, anigoo leh, Taladaydu way hagaagi doontaa, oo
waxaan jeclahay oo dhanna waan wada samayn doonaa. 11
Waxaan xagga bari uga yeedhayaa haad aad u gaajaysan
oo ah ninka taladayda oofinaya oo aan waddan fog uga
yeedhayo. Waan ku hadlay, oo weliba waan oofin doonaa.
Waan u qasdiyey, oo weliba waan samayn doonaa. 12

Kuwiinna qalbiga qallafsan oo xaqnimada ka fogow, bal i
maqla! 13 Xaqnimadaydii waan soo dhowaynayaa, oo iyana
ma ay fogaan doonto, oo badbaadintayduna ma ay raagi
doonto. Reer binu Israa'iil oo sharaftayda ah daraaddood
ayaan badbaadin Siyoon u dhex dhigi doonaa.

47 Gabadha bikradda ah ee Baabuloon ahay, soo deg,
oo ciidda ku fadhiiso, magaalada reer Kaldayiinay,
carshila'aan dhulka ku fadhiiso, waayo, mar dambe adiga
laguuguma yeedhi doono mid dhaylo ah oo jilcisan. 2
Dhagaxshiidyada qaad oo wax shiid, masarka madaxa
ka qaad, oo lugaha qaawi, tan iyo bowdada tafaxaydo,
oo webiyaasha ka gudub. 3 Cawradaada waa la qaawin
doonaa, ceebtaadana waa la arki doonaa. Waan aarsan
doonaa, oo ninna uma tudhi doono. 4 Bixiyahayaga magiciisa
waxaa la yidhaahdaa Rabbiga ciidammada oo ah Kan
Quduuska ah ee reer binu Israa'iil. 5 Magaalada reer
Kaldayiinay, shib dheh oo fadhiiso, meel gudcur ah gal,
waayo, mar dambe laguuguma yeedhi doono sayidaddii
boqortooyooyinka. 6 Waxaan u cadhooday dadkaygii, oo
dhaxalkaygii nijaas baan ka dhigay, oo adigaan gacanta
kuu geliyey. Innaba iyagii uma aadan naxariisan, oo dadka
gaboobay ayaad harqoodkaagii wax culus kaga dhigtay.
7 Waxaad istidhi, Anigu weligayba waxaan ahaan doonaa
sayidad, oo waxyaalahanna qalbiga ma aad gelin, oo
ugudambaystoodiina sooma aadan xusuusan. 8 Haddaba
bal waxyaalahan maqal, taada iska raaxaysata oo istareexa
ku joogtoy. Waxaad qalbiga iska tidhaahdaa, Anigaa ah oo
aniga mooyaane cid kale ma jirto, anigu innaba carmal ma
noqon doono, oo ma gablami doono. 9 Laakiinse labadan
waxyaalood isku maalin qudha ayay isku daqiiqad kuu iman
doonaan, waana gablannimo iyo carmalnimo. Aad iyo aad
bay kuugu soo degi doonaan in kastoo aad saaxirnimo badan
iyo falfal tiro badan badisay. 10 Waayo, waxaad isku hallaysay
sharnimadaada, oo waxaad istidhi, Ninna ima arko. Waxaa
ku qalday xigmaddaada iyo aqoontaada, oo waxaad qalbiga
iska tidhi, Anigaa ah, oo aniga mooyaane cid kale ma jirto.
11 Haddaba sidaas daraaddeed masiibo baa kugu soo degi
doonta, mana aad garan doontid si ay kuugu iman doonto,
belaayaa kugu dhici doonta, oo mana aad kari doontid inaad
iska fogaysid, oo baabbi'id baa si kedis ah kuugu soo degi
doonta, taasoo aadan aqoon. 12 Haddaad ku faa'iidi karaysid
iyo haddaad ku adkaan karaysid, bal haatan la soo istaag
falfalkaaga iyo saaxirnimadaada faraha badan oo aad tan iyo
yaraantaadii ku soo hawshoonaysay. 13 Waxaad ku daashay
talooyinkaagii tirada badnaa, haddaba xiddigayaqaannada,
iyo xiddigasheegyada, iyo xilliyasheegyaduba ha sara
joogsadeen, oo ha kaa badbaadiyeen waxyaalaha kugu
soo degi doona. 14 Bal eeg, iyagu waxay noqon doonaan
sida xaab oo kale, oo dabka ayaa wada gubi doona, oo
iyana xoogga ololka iskama ay samatabbixin doonaan, oo
dabkaasuna ma ahaan doono dhuxul la kulaalo, amase dab
la hor fadhiisto. 15 Saasay kuu noqon doonaan waxyaalihii
aad ku hawshootay, oo kuwii aad macaamilada la lahayd tan
iyo yaraantaadii midkood kastaaba meeshiisuu tegi doonaa,
oo mid ku badbaadiyana ma jiri doono.

48 Reer Yacquubka magaca Israa'iil loogu yeedho, oo
biyihii Yahuudah ka soo baxay, oo magaca Rabbiga ku
dhaarta, oo soo magacaaba Ilaaha Israa'iil, iyagoo aan run
iyo xaqnimo toona ku xusuusanaynow, bal waxan maqla.
2 Waayo, iyagu waxay isugu yeedhaan kuwii magaalada
quduuska ah, oo waxay isku halleeyaan Ilaaha Israa'iil, oo
magiciisa la yidhaahdo Rabbiga ciidammada. 3 Tan iyo
waagii hore ayaan waxyaalihii hore sii sheegayay. Afkaygay
ka soo baxeen, waanan muujiyey. Dhaqsaan u sameeyey,
wayna ahaadeen. 4 Waan ogaa inaad madax adag tihiin,
iyo in qoortiinnu seed bir ah tahay, iyo in jaahiinnu naxaas
yahay, 5 sidaas darteed tan iyo waa hore ayaan idiin sii
sheegayay, oo intayan waxyaalahanu dhicin ayaan idiin sii
muujiyey, waaba intaasoo aad tidhaahdaan, Sanamkayagii
ayaa waxan sameeyey, oo waxaa amray sanamkayagii
xardhanaa iyo sanamkayagii la shubay. 6 Idinku waad
maqasheen, haddaba bal waxan oo dhan arka, idinkuna
miyeydaan sii sheegi doonin? Haatan dabadeed waxaan idin
tusayaa waxyaalo cusub, kuwaasoo ah waxyaalo qarsoon
oo aydaan aqoon. 7 Iyaga haddaa la uumay, ma aad maqlin,
waaba intaasoo aad tidhaahdaan. War mar horeba waannu
niqiin. 8 Idinku ma aydaan maqlin, oo ma aydaan aqoon,
oo dhegtiinnana waa hore ma furmin, waayo, waan ogaa
inaad si khiyaano badan u macaamilooteen, iyo in laydiin
bixiyey Xadgudbayaal tan iyo intaad uurka hooyadiin kasoo
baxdeen. 9 Magacayga aawadiis ayaan idiinka joogsan
doonaa ammaantayda daraaddeed. 10 Bal eega, waan idin
safeeyey, laakiinse sida lacagta ma aha. Oo waxaan idinku
tijaabiyey foornadii dhibaatada. 11 Anigu aawaday, iyo xataa
nafsaddayda qudheeda, ayaan waxan u samayn doonaa,
waayo, magacayga bal side baa loo nijaasayn karaa?
Ammaantayda mid kale siin maayo! 12 Reer Yacquub oo ah
Israa'iilkii aan u yeedhayow, bal i maqla, anigu waxaan ahay
isagii, waxaan ahay kii ugu horreeyey iyo weliba kan ugu
dambeeya. 13 Gacantayda ayaa aasaaska dhulka dhigtay,
oo samooyinkana waxaa kala fidisay midigtayda, oo markaan
u yeedho ayay dhammaantood soo wada istaagaan. 14
Kulligiin soo wada shira oo waxan maqla. Bal yaa iyaga ka

mid ah oo waxyaalahan sii sheegay? Kan Rabbigu jecel
yahay wuxuu Baabuloon ku samayn doonaa siduu doonayo
oo gacantiisu waxay kor saarnaan doontaa reer Kaldayiin.
**15** Aniga qudhayda ayaa sidaas ku hadlay, oo isagaan u
yeedhay oo keenay, oo jidkiisuu ku barwaaqoobi doonaa. **16**
Warroy ii soo dhowaada oo waxan maqla. Tan iyo bilowgii
si qarsoodi ah uma aan hadlin. Tan iyo waagii ay waxanu
dheceen, anigu halkaasaan joogay, oo haatanna waxaa i
soo diray Sayidka Rabbiga ah iyo Ruuxiisa. **17** Rabbiga ah
Bixiyihiinna oo ah Kan Quduuska ah ee reer binu Israa'iil,
wuxuu leeyahay, Anigu waxaan ahay Rabbiga Ilaahiinna ah
oo idin bara waxa idiin wanaagsan oo idinku hoggaamiya
jidkii aad mari lahaydeen. **18** Haddaad amarradayda maqli
lahaydeen, nabaddiinnu waxay noqon lahayd sidii webi
oo kale, oo xaqnimadiinnuna waxay noqon lahayd sidii
hirarka badda oo kale, **19** oo farcankiinnuna wuxuu ahaan
lahaa sidii cammuudda oo kale, oo carruurtiinnuna waxay
ahaan lahayd sidii ciidda oo kale. Magacooda lama gooyeen
oo hortaydana lagama baabbi'iyeen. **20** Idinku Baabuloon
ka soo baxa, oo reer Kaldayiin ka soo carara, oo waxan
hees ku naadiya oo sheega. Waxaad ka sheegtaan xataa
dhulka darafkiisa, oo waxaad tidhaahdaan, Rabbigu wuxuu
soo furtay addoommadiisii reer Yacquub. **21** Oo markuu
lamadegaannada dhex marsiiyeyna ma ay oomin, oo
dhagaxa ayuu biyo uga soo daayay, oo isagu dhagaxii ayuu
kala dillaaciyey, oo markaasay biyihii ka soo butaaceen.
**22** Rabbigu wuxuu leeyahay, Kuwa sharka ah nabadu uma
jirto.

**49** Gasiiradahow, bal i maqla, dadkiinna fogow, bal i
dhegaysta, Rabbigu wuxuu iiga yeedhay maxalka, oo
uurkii hooyaday ayuu iga soo magacaabay. **2** Oo afkaygana
wuxuu ka dhigay sidii seef af badan oo kale, oo hooska
gacantiisa ayuu igu qariyey, wuxuuna iga yeelay sidii fallaadh
fiiqan oo kale, oo gabooyihiisa ayuu igu xaseeyey. **3** Oo
wuxuu igu yidhi, Israa'iilow, waxaad tahay addoonkaygii oo
waan kugu ammaanmi doonaa. **4** Markaasaan idhi, Wax aan
waxba ahayn ayaan u hawshooday, oo xooggaygiina waxaan
ku dhammeeyey baabba' iyo wax aan waxba ahayn, laakiinse
gartaydu waxay la jirtaa Rabbiga oo abaalgudkayguna
wuxuu la jiraa Ilaahayga. **5** Oo haddaba Rabbigii uurka
hooyaday iga soo sameeyey inaan isaga addoon u noqdo si
aan reer Yacquub isaga ugu keeno, oo reer binu Israa'iilna ay
isaga ugu soo wada ururaan, wuu ila hadlay, (waayo, anigu
Rabbiga hortiisa waan ku sharaf badnahay, Ilaahayguna
wuxuu ii noqday xoog iyo itaal) **6** Oo isagu wuxuu leeyahay,
Inaad addoonkaygii ahaatid, oo aad qabiilooyinka reer
Yacquub soo kicisid, iyo inaad kuwii reer binu Israa'iil ka
hadhay soo celisid waa wax fudud, oo weliba quruumahaan
iftiin kaaga dhigi doonaa, si ay badbaadintaydu dhulka
darafkiisa u gaadho. **7** Rabbiga ah Bixiyaha reer binu
Israa'iil iyo Kooda Quduuska ah wuxuu ku leeyahay kan
dadku quudhsado oo quruumuhu karhaan, oo ah taliyayaal
addoonkood, Boqorraa arki doona oo sarajoogsan doona, oo
weliba amiirraa sujuudi doona, waana Rabbiga aaminka ah,
oo ah Kan Quduuska ah ee reer binu Israa'iil, oo ku doortay
aawadiis. **8** Rabbigu wuxuu leeyahay, Wakhti la aqbalay
ayaan kuu jawaabay, oo maalintii badbaadintana waan ku
caawiyey, waanan ku ilaalin doonaa, oo axdi ahaan baan
dadka kuu siin doonaa inaad dhulka hagaajisid oo aad ka
yeeshid in ay dhaxlaan meelihii hantida ahaa ee baabba'ay,
**9** iyo inaad kuwa xidhan ku tidhaahdid, Soo baxa, oo kuwa
gudcurka ku jirana aad ku tidhaahdid, Ismuujiya. Waxay
daaqi doonaan jidadka, oo daaqsintoodana waxay ka heli
doonaan meelaha sare oo dhan. **10** Ma ay gaajoon doonaan,
mana ay harraadi doonaan, oo kulaylka iyo qorraxdu kuma
ay dhici doonaan, waayo, ka iyaga u naxariista ayaa hor kici
doona, oo wuxuu ku hoggaamin doonaa ilo biya ah agtood.
**11** Oo buurahayga oo dhan waxaan ka dhigi doonaa waddo,
oo jidadkayga weynna kor baa loo wada qaadi doonaa. **12**
Bal eega, kuwanu waxay ka iman doonaan meel fog, oo bal
ogaada, kuwanu waxay ka iman doonaan xagga woqooyi
iyo xagga galbeed, oo kuwanuna waxay ka iman doonaan
dalka reer Siiniim. **13** Samooyinkow, heesa, oo dhulkow,
faraxsanow, buurahow, hees ku dhufta, waayo, Rabbigu
dadkiisii wuu qalbi qaboojiyey, oo kuwiisa dhibaataysanna
wuu u naxariisan doonaa. **14** Laakiinse Siyoon waxay tidhi,
Rabbigu waa iga tegey, oo Sayidku waa i illoobay. **15**
Miyaa naagu ilmeheeda nuuga illoobi kartaa inayan wiilkii
uurkeeda ka soo go'ay u naxariisan? Mindhaa kuwaasu way
illoobi karaan, aniguse innaba ku illoobi maayo. **16** Bal eeg,
waxaan kugu calaamadeeyey calaacalaha gacmahayga,
oo derbiyadaaduna had iyo goorba way i hor yaalliin. **17**
Carruurtaadu way soo degdegayaan, oo kuwii ku dumiyey
iyo kuwii cidlada kaa dhigayba way kaa bixi doonaan. **18** Bal
indhahaaga kor u qaad oo hareerahaaga fiiri. Kuwaas oo
dhammu way isa soo wada urursanayaan oo adigay kuu
imanayaan. Rabbigu wuxuu leeyahay, Noloshaydaan ku
dhaartay, hubaal kuwaas oo dhan waxaad u xidhan doontaa
sida sharraxaad oo kale, oo waxaad u huwan doontaa sida
aroosaddu wax u huwato oo kale. **19** Waayo, baabba'aagii
iyo meelahaagii cidloobay iyo dalkaagii burburayba haatan
cidhiidhi bay ku noqon doonaan kuwa ku degaya, oo kuwii ku
liqayna way kaa fogaan doonaan. **20** Carruurta aad dhashay
markaad gablantay dabadeed ayaa kugu odhan doonta

adigoo maqlaya, Meeshu aad bay noogu cidhiidhisan tahay,
haddaba bal meel aannu degno noo bannee. 21 Markaasaad
qalbigaaga iska odhan doontaa, Bal yaa kuwan ii dhalay?
Maxaa yeelay, carruurtaydii waan ka gablamay, oo waxaan
ahay mid cidlowday, oo la masaafuriyey, oo wareegta. Oo bal
yaase kuwan ii koriyey? Waayo, anoo keligay ah ayaa layga
tegey, ee haddaba kuwanu xaggee bay joogeen? 22 Sayidka
Rabbiga ahu wuxuu leeyahay, Bal eeg, quruumahaan u
gacan haadin doonaa, oo calankayga dadyowgaan u taagi
doonaa, oo wiilashaada laabtooday ku keeni doonaan, oo
gabdhahaagana garbahooday ku soo qaadi doonaan. 23 Oo
boqorro waxay kuu noqon doonaan aabbayaal carruurtaada
xannaaneeya, oo boqoradahoodu waxay kuu noqon doonaan
hooyooyin carruurtaada nuujiya. Oo intay jaahooda dhulka
saaraan ayay kuu sujuudi doonaan, oo waxay leefleefi
doonaan ciidda cagahaaga. Markaasaad ogaan doontaa
inaan anigu Rabbiga ahay, oo kuwii i sugaa marnaba
ma ay ceeboobi doonaan. 24 Mid xoog badanu wuxuu
qabsado miyaa laga qaadaa? Miyaase la samatabbixiyaa
maxaabbiistii kan xaqa ah? 25 Laakiinse Rabbigu wuxuu
leeyahay, Xataa kii xoog badan maxaabbiistiisa waa laga
qaadi doonaa, oo kan laga cabsado wuxuu qabsadona waa
laga samatabbixin doonaa, waayo, kii kula dirira waan la
diriri doonaa, oo carruurtaadana waan badbaadin doonaa.
26 Oo kuwii ku dulmana waxaan ku quudin doonaa hilibka
jidhkooda, oo dhiiggoodana waxay ugu sakhraami doonaan
sida khamri macaan, oo binu-aadmiga oo dhammuna waxay
wada ogaan doonaan inaan anigoo Rabbiga ahu ahay
Badbaadiyahaaga, iyo Bixiyahaaga, iyo Kan xoogga badan
ee reer Yacquub.

50 Rabbigu wuxuu leeyahay, Meeday warqaddii furniinka
ee hooyadiin, oo aan ku eryay? Waase kuma kan ka
mid ah kuwa daynka iga qaba oo aan idinka iibiyey? Bal
eega, xumaatooyinkiina aawadood ayaa laydiin iibiyey, oo
xadgudubyadiinna aawadood ayaa hooyadiin lagu furay. 2
Haddaba markaan imid, muxuu ninna u jirin? Oo markaan
dhawaaqayse maxaa la iigu jawaabi waayay? Miyaa innaba
gacantaydu gaaban tahay si ayan wax u furan karin? Amase
miyaanan lahayn xoog aan wax ku samatabbixiyo? Bal eega,
canaantayda ayaan badda ku engejiyaa, oo webiyaashana
cidlo baan ka dhigaa. Kalluunkoodu biyola'aan aawadeed
buu la soo uraa, oo oon buu u dhintaa. 3 Samooyinka madow
baan huwiyaa, oo dhar joonyad ah ayaan go' uga dhigaa. 4
Sayidka Rabbiga ah ayaa afka kuwa wax bartay i siiyey inaan
ogaado si aan hadal ugu taageero kan daallan. Subax kastuu
i toosiyaa, subax walbana dhegtayduu u toosiyaa inaan wax
u maqlo sida kuwa wax bartay. 5 Sayidka Rabbiga ah ayaa
dhegtayda furay, oo aniguna ma aan caasiyoobin, oo dibna
ugama aan noqon. 6 Kuwii i karbaashay ayaan dhabarkaygii
u duway, oo kuwii timaha iga rifayna dhabannadaydaan u
duway. Wejigaygiina ceeb iyo candhuuf toona kama aan
qarin. 7 Waayo, waxaa i caawin doona Sayidka Rabbiga
ah, oo sidaas daraaddeed ma aan sharafjabin, oo sidaas
daraaddeed ayaan wejigaygii uga dhigay sidii dhagaxmadow
oo kale, oo waxaan ogahay inaanan ceeboobi doonin. 8 Ka
xaq iga dhiga wuu dhow yahay, bal yaa ila diriraya? Aannu
isla wada istaagno. Waa kuma kan cadowgayga ahu? Ha
ii soo dhowaado. 9 Bal eega, Sayidka Rabbiga ah ayaa i
caawinaya, haddaba waa kuma kan i xukumi doonaa? Bal
ogaada, iyagu dhammaantood sida dhar duugoobay bay u
gaboobi doonaan, oo kulligood aboor baa cuni doona. 10
Bal yaa idinka mid ah oo Rabbiga ka cabsada, oo codka
addoonkiisa addeeca? Kan gudcurka ku dhex socda, oo
aan iftiin lahaynu magaca Rabbiga ha aamino, oo Ilaahiisa
ha isku halleeyo. 11 Kuwiinna dabka shida, oo ololka isku
hareereeya oo dhammow, iftiinka dabkiinna iyo ololka aad
shidateen ku socda. Waxaas gacantaydaad ka heli doontaan,
oo waxaad ku jiifsan doontaan tiiraanyo.

51 Kuwiinna xaqnimada raaca oo Rabbiga doondoonow,
bal i maqla. Bal eega dhagaxii laydinka gooyay iyo
godkii laydinka soo qoday. 2 Bal eega aabbihiin Ibraahim,
iyo Saarahdii idin dhashay, waayo, markuu mid qudha
ahaa ayaan u yeedhay, waanan barakeeyey, oo tarmiyey.
3 Waayo, Rabbigu Siyoon wuu u qalbi qabowjiyey, oo
meelaheeda baabba'ay oo dhanna wuu u qalbi qabowjiyey,
cidladeedana wuxuu ka dhigay sidii Ceeden oo kale,
oo lamadegaankeedana sidii beertii Rabbiga oo kale, oo
dhexdeedana waxaa laga heli doonaa farxad iyo rayrayn,
iyo mahadnaqid iyo cod heeseed. 4 Dadkaygow, i maqla,
oo quruuntaydoy, dhegta ii dhiga, waayo, sharci baa iga
soo bixi doona, oo caddaaladdaydana waxaan ka dhigi
doonaa inay dadyowga iftiin u noqoto. 5 Xaqnimadaydii
way soo dhowdahay, badbaadintaydiina way soo baxday,
oo gacmahayguna dadyowgay u garsoori doonaan,
gasiiraduhuna anigay i sugi doonaan, oo gacantayday
isku hallayn doonaan. 6 Bal indhihiinna samooyinka ku
taaga, oo haddana dhulka hoose fiiriya, waayo, samooyinku
sida qiiq oo kale bay u libdhi doonaan, oo dhulkuna sida
dhar buu u duugoobi doonaa, oo kuwa degganuna sidaas
oo kalay u dhiman doonaan, laakiinse badbaadintaydu
weligeedba way sii waari doontaa, oo xaqnimadayduna
weligeed ma dhammaan doonto. 7 Kuwiinna xaqnimada

yaqaanow, dadka sharcigaygu qalbigooda ku jirow, bal i
maqla. Dadka canaantiisa ha ka cabsanina, caydiisana ha
ka qalbi jabina. 8 Waayo, aboor baa sida dhar oo kale u
cuni doona, oo dixiri baa sida dhogor oo kale u cuni doona,
laakiinse xaqnimadaydu weligeedba way sii waari doontaa,
oo badbaadintayduna tan iyo ab ka ab way sii jiri doontaa.
9 Gacanta Rabbigoy, toos oo toos, oo xoog yeelo, oo u
toos sidii waayihii hore, iyo sidii qarniyadii hore. Miyaadan
ahayn tii Rahab googooysay oo bahalbadeeddii mudday? 10
Miyaadan ahayn tii engejisay baddii ahayd biyihii moolka
dheeraa? Sow ma aad tihid tii badda moolkeeda jidka ka
samaysay in kuwa la soo furtay ay ku gudbaan? 11 Oo
kuwa Rabbigu soo furtay way soo noqon doonaan, iyagoo
gabyaya ayay Siyoon iman doonaan, oo madaxoodana
farxad weligood ah ayaa saarnaan doonta, oo waxay heli
doonaan farxad iyo rayrayn, oo tiiraanyo iyo taahna way
carari doonaan. 12 Aniga qudhayda weeye kan ku qalbi
qaboojiya. Maxaad tahay waadiga nin dhimanaya iyo binu-
aadmi sida caws oo kale u baabba'aya ka cabsanayee? 13
Ma waxaad illooday Rabbiga ku sameeyey oo samooyinka
kala bixiyey, oo dhulka aasaaskiisa dhigay, oo ma waxaad
had iyo goor maalin kasta ka cabsanaysaa kan wax dulma
cadhadiisa, sidii isagoo diyaar u ah inuu wax baabbi'iyo?
Haddaba bal meeday kan wax dulma cadhadiisu? 14
Maxbuuska la masaafuriyey dhaqso baa loo furi doonaa,
oo ma uu dhiman doono, yamayskana ma geli doono,
cuntadiisana ma uu waayi doono. 15 Laakiinse anigu waxaan
ahay Rabbiga Ilaahaaga ah oo badda isku walaaqa si ay
mawjadaheedu u guuxaan. Magiciisa waxaa la yidhaahdaa
Rabbiga ciidammada. 16 Oo erayadaydii ayaan afkaaga
geliyey, hooskii gacantaydana waan kugu daboolay si aan
samooyinka u kala bixiyo, oo aan aasaaska dhulka u dhigo,
oo aan reer Siyoonna ugu idhaahdo, Dadkayga baad tihiin.
17 Yeruusaalemay tii gacanta Rabbiga koobkii cadhadiisa
ka cabtayay, toos oo toos, oo sara joogso. Waxaad cabtay
koobka lagu dhacdhaco, waadna heensatay. 18 Wiilashii ay
dhashay oo dhan laguma arko mid iyada haga, oo wiilashii
ay korisay oo dhanna laguma arko mid iyada gacanta qabta.
19 Labadan waxyaalood ayaa kugu dhacay. Bal yaa kuu
barooran doona? Baabba' iyo halaag, iyo abaar iyo seef.
Haddaba bal sidee baan kuu qalbi qabowjin doonaa? 20
Wiilashaadii aad bay u daaleen, waxayna dhinac yaalliin
jidadka oo dhan sida biciid dabin ku dhacay. Waxay ka
wabxeen cadhadii Rabbiga iyo canaantii Ilaahaaga. 21
Haddaba taada dhibaataysan oo ku sakhraantay wax aan
khamri ahaynay, bal waxan maqal: 22 Sayidkaaga Rabbiga
ah oo ah Ilaahaaga dacwada dadkiisa u muddaca wuxuu
leeyahay, Bal eeg, waxaan gacantaada ka bixiyey koobka
lagu dhacdhaco, kaasoo ah koobka cadhadayda. Adigu mar
dambe innaba ma aad cabbi doontid. 23 Laakiinse waxaan
gacanta u gelin doonaa kuwa ku dhiba, oo naftaada ku
yidhi, Dhambacaadso aan kugu gudubnee, oo adna kuwii
gudbayay ayaad dhabarkaagii uga dhigtay sida dhulka oo
kale, iyo sida jidka oo kale.

52 Siyoonay, toos oo toos, oo xooggaaga xidho.
Yeruusaalemay, magaalada quduuska ahay, dharkaaga
quruxda badan xidho, waayo, hadda ka dib kuwa buuryoqab
ah iyo kuwa nijaas ah toona kuma ay soo geli doonaan. 2
Yeruusaalemay, boodhka iska jaf oo ka kac, oo fadhiiso,
magaalada Siyoon oo maxbuusad ahayday, iska fur waxa
qoorta lagaaga xidhay. 3 Waayo, Rabbigu wuxuu leeyahay,
Idinka waxaa laydinku iibiyey wax aan waxba ahayn, oo
haddana lacagla'aan baa laydinku soo furan doonaa. 4
Waayo, Sayidka Rabbiga ahu wuxuu leeyahay, Dadkaygii
waa horay Masar ku dhaadheceen inay halkaas joogaan, oo
kii reer Ashuurna sababla'aan buu u dulmay. 5 Haddaba
sidaas daraaddeed Rabbigu wuxuu leeyahay, Bal maxaa
halkan ii jira marka dadkayga waxaan waxba ahayn lagu
kaxaystay? Rabbigu wuxuu leeyahay, Kuwa iyaga u taliyaa
way qayliyaan, oo magacaygana had iyo goor maalin
kastaba waa la caayaa. 6 Sidaas daraaddeed dadkaygu
magacaygay aqoonsan doonaan, oo sidaas daraaddeed
waxay maalintaas garan doonaan inaan anigu ahay kan
hadla, bal eega, waa i kane. 7 Buuraha dushooda ku
qurux badanaa cagaha kan warka wanaagsan keena,
oo nabadda naadiya, oo waxyaalaha wanaagsan warka
wanaagsan ka keena, oo badbaadada naadiya, oo Siyoon
ku yidhaahda, Ilaahaagii baa boqornimada haysta. 8 Waa ka
codka waardiyayaashaadu! Codkooday kor u qaadayaan, oo
dhammaantood way wada heesayaan, waayo, indhahooday
ku arki doonaan markii Rabbigu Siyoon ku soo noqonayo.
9 Yeruusaalem meelaheeda baabba'ayow, dhammaantiin
farxa, oo kulligiin hees ku dhufta, waayo, Rabbigu dadkiisii
wuu qalbi qaboojiyey, oo Yeruusaalemna wuu soo furtay. 10
Waayo, Rabbigu wuxuu gacantiisii quduuska ahayd bayaan
ugu muujiyey quruumaha oo dhan hortooda, oo dhulka
darafyadiisa oo dhammuna waxay wada arki doonaan
badbaadinta Ilaaheenna. 11 Kuwiinna weelasha Rabbiga
sidow, taga, oo taga, oo halkaas ka soo baxa, ha taabanina
wax aan daahir ahayn, oo iyada ka dhex baxa, oo daahir
ahaada. 12 Waayo, degdeg kuma bixi doontaan oo qixidna
kuma carari doontaan, maxaa yeelay, Rabbiga ayaa idin
hor kici doona, oo Ilaaha reer binu Israa'iil ayaa idin daba

socon doona. 13 Bal eega, addoonkaygu caqli buu yeelan
doonaa, oo waa la sarraysiin doonaa, oo kor baa loo kicin
doonaa, wuxuuna noqon doonaa mid aad u sarreeya. 14
Waxaa jaahiisii loo xumeeyey si ka daran sida nin kale loo
xumeeyo, suuraddiisiina waxaa loo xumeeyey si ka daran
sida binu-aadmiga loo xumeeyo oo kale, haddaba sidii kuwa
badanu ula yaabi jireen oo kale, 15 ayuu isaguna quruumo
badan uga yaabin doonaa, oo boqorraduna waxay afkooda
u xidhi doonaan isaga aawadiis, waayo, waxay arki doonaan
wax aan weligood loo sheegin, oo waxay ka fiirsan doonaan
wax ayan weligood maqal.

53 Bal yaa warkayagii rumaystay? Oo yaa gacantii
Rabbiga loo muujiyey? 2 Waayo, isagu hortiisuu ku
koray sidii geed curdan ah, iyo sidii xidid dhul engegan ka
soo baxay oo kale. Isagu suurad iyo qurux aynu ku fiirinno
toona ma leh, oo qurux aynu ku jeclaanno laguma arko. 3
Isaga waa la quudhsaday, waana la diiday, oo wuxuu ahaa
nin murugeed, oo xanuun bartay, waana la quudhsaday sida
mid dadku wejiga ka qarsado, mana aynaan xurmayn. 4
Sida runta ah wuxuu xambaartay xanuunyadeennii, wuxuuna
qaatay murugadeennii, laakiinse waxaynu ku tirinnay mid
belaayo ku dhacday, oo Ilaah dilay, oo dhibaataysan. 5
Laakiinse waxaa isaga loo dhaawacay xadgudubyadeenna,
waxaana loo nabareeyey xumaatooyinkeenna, edbintii
nabaadiinadeennana dushiisay ku dhacday, dildillaaciisiina
waynu ku bogsannay. 6 Dhammaanteen sidii ido baynu u
hallownay, midkeen waluba jidkiisuu u leexday, oo Rabbigu
wuxuu isaga dul saaray xumaanteenna oo dhan. 7 Isaga
waa la dulmay, waana la dhibay, laakiinse innaba afkiisii
ma uu kala qaadin. Isaga sidii wan la qalayo baa loo
kexeeyey, oo sidii lax ku aamusan kuwa dhogorta ka xiira
hortooda, isagu afkiisa ma uu furin. 8 Isaga dulmi iyo
xukun baa lagu sii qaaday. Haddaba bal yaa qarnigiisii
ka mid ahaa oo u maleeyey in isaga laga gooyay dalkii
kuwa nool? Xadgudubka dadkayga daraaddiis ayaa isaga
loo garaacay. 9 Xabaashiisiina waxaa lagu daray kuwii
sharka lahaa, dhimashadiisiina mid taajir ahaa, in kastoo
uusan dulmi samayn, khiyaanona aanay afkiisa ku jirin. 10
Habase ahaatee waxaa Rabbigu raalli ka noqday inuu isaga
nabareeyo. Wuxuu isaga ku riday xanuun. Markaad naftiisa
qurbaan dembi ka dhigtid ayuu arki doonaa farcankiisii,
cimrigiisuna waa dheeraan doonaa, oo Rabbiga doonistiisuna
gacantiisay ku liibaani doontaa. 11 Wuxuu arki doonaa waxay
naftiisu ku dhibtootay, wuuna u riyaaqi doonaa. Addoonkayga
xaqa ahuna aqoontiisa ayuu kuwa badan xaq kaga dhigi
doonaa, wuxuuna xambaari doonaa xumaatooyinkooda. 12
Sidaas daraaddeed waxaan isaga wax ula qaybin doonaa
kuwa waaweyn, isna wuxuu boolida la qaybsan doonaa
kuwa xoogga badan, maxaa yeelay, isagu naftiisuu geeri u
huray, waxaana lagu tiriyey kuwa xadgudbay, weliba wuxuu
xambaartay kuwa badan dembigood, wuuna u duceeyey
kuwa xadgudbay.

54 Rabbigu wuxuu leeyahay, Faraxsanow, madhalaysta
aan dhalinay, hees ku dhufo oo mashxarad, taada
aan carruur ku foolanay, waayo, tan cidlowday carruurteedu
waa ka badan yihiin tan ninka leh carruurteeda. 2 Meesha
teendhadaada ballaadhi, oo rugahaaga daahyadoodana
ha la kala bixiyo. Waxba ha la hadhin, xadhkahaaga sii
dheeree, oo dhidbahaagana sii xoogee. 3 Waayo, waxaad
u kala faafi doontaa xagga midigta iyo xagga bidixdaba,
oo farcankaaguna wuxuu dhaxli doonaa quruumaha, oo
magaalooyinka baabba'ayna wuxuu ka dhigi doonaa in la
dego. 4 Ha cabsan, waayo, ma aad ceeboobi doontid,
hana sharafjabin, waayo, laguma ceebayn doono, oo
ceebtii yaraantaadana waad illoobi doontaa, oo ceebtii
carmalnimadaadana innaba mar dambe sooma aad xusuusan
doontid. 5 Waayo, Uumahaaga ayaa ninkaaga ah, oo
magiciisana waxaa la yidhaahdaa Rabbiga ciidammada.
Kan Quduuska ah ee reer binu Israa'iilna waa Bixiyahaaga,
oo waxaa isaga la odhan doonaa Ilaaha dhulka oo dhan.
6 Waayo, Ilaahaagu wuxuu leeyahay, Anoo Rabbiga ahu
waxaan kuugu yeedhay sidii adoo ah naag laga tegey oo
nafsaddeedu murugootay, iyo sidii bilcaan yaraanteedii lagu
nacay oo kale. 7 Muddo yar baan kaa tegey, laakiinse
waxaan kugu soo ururin doonaa naxariis badan. 8 Rabbiga
Bixiyahaaga ahu wuxuu leeyahay, Muddo gaaban ayaan
cadho yar wejigayga kaaga qariyey, laakiinse raxmad
weligeed ah ayaan kuugu naxariisan doonaa. 9 Maxaa
yeelay, tanu waxay iila mid tahay sidii biyihii wakhtigii Nuux
oo kale, waayo, sidaan ugu dhaartay inaanay biyihii Nuux
mar dambe dhulka kor mari doonin ayaan ugu dhaartay
inaanan mar dambe kuu cadhoon doonin, iyo inaanan innaba
ku canaanan doonin. 10 Waayo, Rabbiga kuu naxariistaa
wuxuu leeyahay, In kastoo ay buuruhu fogaadaan oo ay
kuruhuna dhaqdhaqaaqaan raxmaddaydu innaba kaa fogaan
mayso, oo axdigayga nabdeedna dhaqdhaqaaqi maayo.
11 Taada dhibaataysan, oo duufaanku rogrogay, oo aan la
qalbi qabowjinay, bal eeg, dhagaxyadaada waxaan ku qurxin
doonaa midabyo kala cayncayn ah, oo aasaaskaagana
waxaan ka samayn doonaa dhagaxyo safayr la yidhaahdo. 12
Oo daaqadahaagana waxaan ka samayn doonaa dhagaxyo
cascas oo yaaquud la yidhaahdo, irdahaagana waxaan ka

samayn doonaa dhagaxyo dhalaalaya, oo derbigaaga oo
dhanna waxaan ka samayn doonaa dhagaxyo qaali ah. 13
Oo Rabbigu carruurtaada oo dhan ayuu wax bari doonaa, oo
nabadda carruurtaaduna waxay ahaan doontaa mid weyn. 14
Xaqnimaad ku dhismi doontaa, oo dulmina waad ka fogaan
doontaa, waayo, ma aad cabsan doontid, oo cabsigelintana
waad ka fogaan doontaa, waayo, innaba kuuma ay soo
dhowaan doonto. 15 Bal ogow, haddii dagaal laysu soo
wada urursado xaggayga kama iman doono. Ku alla kii
dagaal kugu kiciyaaba aawadaa buu u dhici doonaa. 16 Bal
eeg, anigaa abuuray birtumaha dabka dhuxuleed afuufa
oo hub dagaal u soo saara, oo weliba waxaan abuuray
kan wax dumiya inuu wax baabbi'iyo aawadeed. 17 Hub
laguu samaystay oo liibaanaya ma jiro, oo af kasta oo
garsoorid kuugu kacana waad xukumi doontaa, Rabbigu
wuxuu leeyahay, Kanu waa dhaxalkii addoommada Rabbiga,
oo xaqnimadooduna xaggaygay ka timid.

**55** Hoy, kuwiinna oomman oo dhammow, xagga biyaha
kaalaya, xataa kii aan lacag haysanow, kaalaya,
wax iibsada, oo wax cuna, kaalaya oo khamri iyo caano
lacagla'aan iyo iibla'aan ku qaata. 2 Haddaba bal maxaad
lacag ugu bixisaan wax aan cunto ahayn? Oo wixii aad
ku hawshooteenna maxaad ugu bixisaan wax aan idin
dherjinayn? Bal aad ii maqla, oo waxa wanaagsan cuna,
oo naftiinnuna ha iskaga istareexdo barwaaqo miidhan. 3
Dhegihiinna soo dhiga, oo ii kaalaya, i maqla oo naftiinnuna
way noolaan doontaa, oo anna waxaan idinla dhigan doonaa
axdi weligiis ah, kaasoo ah waxyaalahii naxariista lahaa oo
la hubo ee aan Daa'uud u ballanqaaday. 4 Bal eega, isagaan
dadyowga markhaati uga dhigay, oo hoggaamiye iyo taliyena
dadyowgaan uga dhigay. 5 Bal eeg, waxaad u yeedhi
doontaa quruun aadan aqoon, oo quruun aan ku aqoonna
way kuu soo ordi doontaa, waana Rabbiga ah Ilaahaaga iyo
kan Quduuska ah ee reer binu Israa'iil aawadiis, waayo, wuu
ku sharfay. 6 Rabbiga doondoona inta isaga la heli karo, oo
isaga barya intuu dhow yahay. 7 Ka sharka lihi jidkiisa ha ka
tago, ninka aan xaqa ahaynuna fikirradiisa, oo Rabbiga ha
u soo noqdo, oo isna wuu u naxariisan doonaa, oo ha u
yimaado Ilaaheenna, waayo, aad buu u saamixi doonaa. 8
Waayo, Rabbigu wuxuu leeyahay, Fikirradaydu fikirradiinna
ma aha, oo jidadkiinnuna jidadkayga ma aha. 9 Maxaa
yeelay, sida samooyinku ay dhulka uga sarreeyaan ayay
jidadkaygu jidadkiinna uga sarreeyaan, oo ay fikirradayduna
fikirradiinna uga sarreeyaan. 10 Waayo, sida roobka iyo
barafka cadu ay samada uga da'aan, oo ayan halkaas ugu
noqon, laakiinse ay dhulka u waraabiyaan oo ay uga dhigaan
inuu soo bixiyo oo magoolo, si uu abuur u siiyo kan wax
abuurta, oo uu cunto u siiyo kan wax cuna, 11 sidaas oo
kaluu ereygii afkayga ka soo baxaa noqon doonaa, oo isagoo
madhan igu soo noqon maayo, laakiinse wuxuu oofinayaa
wixii aan ula qasdiyey, waana ku soo liibaanayaa wixii aan u
diray. 12 Waayo, farxad baad la bixi doontaan, oo nabad
baa laydinku hoggaamin doonaa, oo buuraha iyo kuruhuna
hortiinnay hees ku dhufan doonaan, oo dhirta duurka oo
dhammuna way sacbin doonaan. 13 Qodaxda meesheedii
waxaa ka soo bixi doona geed beroosh ah, oo maraboobta
meesheediina waxaa ka soo bixi doona geed hadaas ah, oo
taasu waxay Rabbiga u ahaan doontaa magac iyo calaamad
weligeed sii waaraysa oo aan la baabbi'in doonin.

**56** Rabbigu wuxuu leeyahay, Caddaaladda dhawra oo
xaqnimada sameeya, waayo, badbaadintaydu way soo
dhow dahay inay timaado, oo xaqnimadayduna dhaqsay u
soo muuqan doontaa. 2 Waxaa barakaysan ninkii waxan
sameeya iyo binu-aadmigii waxan xajiya, oo sabtida dhawra
si uusan u nijaasayn, oo gacantiisana dhawra si ayan
innaba wax shar ah u samayn. 3 Shisheeyihii Rabbiga
raacay yuusan odhanin, Hubaal Rabbigu dadkiisa wuu iga
sooci doonaa, oo ninkii bohon ahuna yuusan odhanin, Bal
eega, anigu waxaan ahay geed qallalan. 4 Waayo, Rabbigu
wuxuu leeyahay, Bohommada sabtiyadayda dhawra, oo wixii
iga farxiya doorta, oo axdigayga aad u xajiya 5 waxaan
gurigayga iyo derbiyadayda dhexdooda ku siin doonaa
meel iyo magac ka sii wanaagsan wiilal iyo gabdhoba.
Waxaan iyaga siin doonaa magac weligiis sii waaraya oo
aan la baabbi'in doonin. 6 Oo Rabbigu wuxuu leeyahay,
Weliba shisheeyayaasha i raaca inay ii adeegaan, iyo inay
magacayga jeclaadaan, oo ay addoommo ii ahaadaan,
mid kasta oo sabtida dhawra si uusan u nijaasayn, oo
axdigaygana aad u xajiya, 7 kuwaas oo dhan buurtayda
quduuska ah ayaan keeni doonaa, oo gurigayga tukashada
ayaan kaga farxin doonaa. Qurbaannadooda la gubo iyo
allabaryadooda ay meeshayda allabariga ku kor bixiyaan
waa la aqbali doonaa, waayo, gurigayga waxaa dadyowga
oo dhan loogu yeedhi doonaa guriga tukashada. 8 Sayidka
Rabbiga ah oo masaafurisyadii dadka Israa'iil soo ururiyaa
wuxuu leeyahay, Weliba waxaan u soo ururin doonaa qaar
kale oo aan ahayn kuwoodii la ururiyey. 9 Dugaagga duurka
jooga oo dhan iyo dugaagga duudda oo dhammow, kaalaya
aad wax cunteene. 10 Waardiyayaashiisu waa indha la'
yihiin, oo kulligoodna aqoon ma leh, dhammaantoodna
waa eeyo carrab la' oo aan ciyi karin. Way riyoodaan oo
jiifaan, oo jecel yihiin inay hurdaan. 11 Eeyadu way hunguri

weyn yihiin, weligoodna ma dhergi karaan, oo kuwaasuna
waa adhijirro aan innaba wax garan karin. Kulligood waxay
u leexdeen jidkoodii, oo midkood kastaaba xataa kii ugu
dambeeyey wuxuu iska daba galay faa'iidadiisii. 12 Oo
waxay yidhaahdaan, Kaalaya khamri baan doonan doonaaye
oo wax lagu sakhraamo baynu ka soo dhergi doonnaaye,
oo berrina waxay ahaan doontaa sida maanta oo kale, oo
weliba ka sii weyn.

**57** Kan xaqa ah wuu halligmaa, oo ninna qalbiga ma geliyo.
Cibaadalaawayaashana waa la kexeeyey, oo ciduna
ma garato in kan xaqa ah belaayada soo socota laga waday.
2 Isagu wuu nabad galaa, oo mid kasta oo qummanaantiisa
ku socdana sariirtiisuu ku nastaa. 3 Laakiinse wiilasha
saaxiradda, oo ah farcankii dhillayga iyo dhilladu ay iska
dhaleenow, bal halkan u soo dhowaada. 4 Bal yaad ku
cayaaraysaan? Oo bal yaad afka ku kala qaadaysaan oo
aad carrabka ku soo taagaysaan? Sow idinku ma ihidin
carruurtii xadgudubka iyo farcankii beenta, 5 idinkoo geedaha
dhexdooda iyo geed kasta oo cagaar ah hoostiisa iskula
kacsada, oo carruurta dooxooyinka iyo meelaha dhagaxyada
dillaacsan ka hooseeya ku gowraca. 6 Qaybtaadu waxay
dhex taallaa dhagaxyada siman oo dooxada dhex yaal, oo
iyaga qudhoodu waa qaybtaada, waayo, iyagaad qurbaan
cabniin ah u daadisay, oo iyagaad qurbaan u bixisay.
Haddaba bal miyaan waxyaalahaas raalli ka noqon doonaa?
7 Waxaad sariirtaadii dul dhigatay buur sarraysa oo dheer, oo
halkaasaad sii fuushay inaad allabari ku bixisid aawadeed. 8
Oo albaabbada iyo tiirarka dabadooda ayaad xusuustaadii
qotonsatay, waayo, waxaad isu qaawisay mid kale oo aan
aniga ahayn, waanad sii fuushay, oo sariirtaadiina waad sii
ballaadhisay, oo axdi baad iyaga la dhigatay. Sariirtoodana
meeshaad ku aragtay waad ku jeceshahay. 9 Saliid baad
boqorka ula tagtay, oo cadarkaagiina waad iska sii badisay,
ergooyinkaagiina meel fog baad u dirtay, oo ceeb baad ku
dhaadhacday tan iyo She'ool. **(Sheol h7585)** 10 Waxaad ku
daashay jidkaaga dhererkiisa, laakiinse ma aad odhan, Rajo
ma leh. Waxaad heshay xoog cusub, oo sidaas daraaddeed
ma aadan taag qabin. 11 Oo bal yaad ka baqday oo aad ka
cabsatay, oo aad saas darteed been u sheegtay oo aadan
ii soo xusuusan, ama aadan innaba xaalkan qalbigaaga
u gelin? Miyaanan wakhti dheer iska aamusin? Oo ma
sidaas aawadeed baadan iiga cabsanayn? 12 Waxaan
sheegi doonaa xaqnimadaada iyo shuqulladaada, iyaguse
waxba kuuma tari doonaan. 13 Markaad qayshatid, bal
guutooyinkaagu ha ku samatabbixiyeen, laakiinse iyaga
dabayl baa qaadi doonta, oo neef baa wada kaxayn doonta,
laakiinse kii isku kay halleeyaa dalkuu hantiyi doonaa oo
wuxuu dhaxli doonaa buurtayda quduuska ah. 14 Oo isna
wuxuu odhan doonaa, Dhisa, dhisa, oo jidka hagaajiya,
oo jidka dadkayga waxa lagu turunturoodo ka wareejiya.
15 Waayo, Kan dheer oo sarreeya, oo weligiis waara, oo
magiciisu Quduuska yahay wuxuu leeyahay, Anigu waxaan
degganahay meesha sare oo quduuska ah, oo weliba
waxaan la jiraa kan toobadkeena oo is-hoosaysiiya inaan
soo nooleeyo ruuxa kuwa is-hoosaysiiya, iyo inaan soo
nooleeyo qalbiga kuwa toobadkeena. 16 Waayo, ilaa weligay
diriri maayo oo ilaa weligay sii cadhaysnaan maayo, haddii
kalese ruuxii iyo nafihii aan abuurayba hortayda way ku
taag darnaan lahaayeen. 17 Xumaantii hunguriweynaantiisa
aawadeed ayaan u cadhooday oo aan wax ugu dhuftay.
Waan isqariyey oo waan cadhooday, oo isna wuu ku sii
leexday xagga jidkii qalbigiisa. 18 Jidadkiisii waan arkay,
laakiinse isagaan bogsiin doonaa, oo weliba waan soo
hoggaamin doonaa, oo isaga iyo kuwa u barooranayaba
waan qalbiqaboojin doonaa. 19 Rabbigu wuxuu leeyahay,
Anigu midhaha bushimahaan abuuraa. Nabad iyo nabadu
ha u ahaato kan fog iyo kan dhowba. Oo isagaan bogsiin
doonaa. 20 Laakiinse kuwa sharka ahu waa sida bad
kacsan oo kale, waayo, iyadu innaba ma xasilli karto, oo
biyaheeduna waxay kor u soo xooraan wasakh iyo dhoobo.
21 Ilaahaygu wuxuu leeyahay, Kuwa sharka ah nabadu uma
jirto.

**58** Aad u qayli, oo waxba ha iskula hadhin, codkaagana
sida buun oo kale kor u qaad, oo dadkayga
xadgudubkooda u sheeg, oo reer Yacquubna dembiyadooda
u sheeg. 2 Laakiinse iyagu maalin kasta way i doondoonaan,
oo waxay jecel yihiin inay jidadkayga ogaadaan. Sidii quruun
xaqnimo samaysay oo aan innaba amarkii Ilaahooda ka tegin
waxay i weyddiistaan amarro xaq ah, oo waxay aad u jecel
yihiin inay Ilaah ku soo dhowaadaan. 3 Waxay leeyihiin, Bal
maxaannu u soonnay oo aad u arki weyday? Bal maxaannu
naftayada u dhibnay oo aad u daymoon weyday? Bal
eega, maalintii aad soontaan waad iska raaxaysataan, oo
shaqaalihiinna oo dhanna waad dulantaan. 4 Bal eega, idinku
waxaad u soontaan dirir iyo dood keliya, iyo inaad feedhkii
sharnimada wax ku dhufataan. Maanta uma soontaan si
codkiinna xagga sare looga maqlo. 5 Soonkii aan doortay
ma waxaas oo kalaa? Ma maalin nin naftiisa dhibo baa? Ma
inuu madaxiisa sida cawsduur u foororsho, oo uu hoostiisa
dhar joonyad ah iyo dambas ku goglo baa? Waxaa ma
waxaad tidhaahdaan, Waa soon iyo maalin Rabbigu aqbali
karo? 6 Sow kanu ma aha soonkii aan doortay in silsiladihii

sharnimada la furo, oo guntimihii harqoodka la debciyo,
oo kuwa la dulmay la xoreeyo, oo aad harqood kasta
jebisaan? 7 Sow ma aha inaad kibistaada ka gaajaysan u
gooysid, oo aad masaakiinta aan hoy lahayn gurigaaga soo
gelisid, oo markaad aragtid mid qaawan aad wax huwisid,
oo aadan xigtadaada aad isku jiidhka tihiin ka dhuuman?
8 Oo markaas iftiinkaagu wuxuu u soo kaahi doonaa sida
kaaha waaberi, oo bogsiintaaduna dhaqso bay u soo bixi
doontaa, oo xaqnimadaaduna way ku hor socon doontaa,
oo ammaanta Rabbiguna way ku daba socon doontaa. 9
Markaasaad dhawaaqi doontaa, oo Rabbiguna waa kuu
jawaabi doonaa, waad u qayshan doontaa, oo isna wuxuu ku
odhan doonaa, Waa i kan. Haddaad dhexdaada ka fogaysid
harqoodka, iyo farta fiiqiddeeda, iyo hadlidda sharka ah, 10
oo haddaad ka gaajaysan quudkaaga siisid, oo aad nafta
dhibaataysan dherjisid, markaas iftiinkaagu gudcur buu ka
soo dhex kaahi doonaa, oo madowgaaguna wuxuu noqon
doonaa sida hadh cad oo kale. 11 Oo Rabbiguna had iyo
goorba wuu ku hoggaamin doonaa, oo iyadoo abaar ah ayuu
naftaada dherjin doonaa, lafahaagana wuu adkayn doonaa,
oo adna waxaad noqon doontaa sida beer la waraabiyey,
iyo sida il biya ah oo aan innaba biyeheedu gudhin. 12 Oo
kuwaaga ayaa meelihii hore oo burburay dhisi doona, oo
waxaad sara kicin doontaa aasaasyada qarniyada badan, oo
waxaa laguugu yeedhi doonaa Jabniinkabe, iyo kan jidadka
cusboonaysiiya si loo dego. 13 Haddaad sabtida cagtaada
ula hadhid si aadan maalintayda quduuska ah damacaaga u
samayn, aadse sabtida ugu yeedhid farxad, iyo tan quduuska
ah ee Rabbiga, oo sharafta badan, iyo haddaad sabtida
sharaftid, adigoo aan siyaalahaaga samaynayn, ama aan
damacaaga daba galayn, ama aan hadalkaaga ku hadlayn,
14 markaasaad Rabbiga ku farxi doontaa, oo anna waxaan
ku marsiin doonaa meelaha sarsare ee dhulka, oo dhaxalkii
awowgaa Yacquub ayaan kugu quudin doonaa, waayo, afkii
Rabbiga ayaa saas ku hadlay.

**59** Bal eega, Rabbiga gacantiisu inay wax badbaadiso
kama gaabna, oo dhegihiisuna inay wax maqlaan kama
awdna, 2 laakiinse xumaatooyinkiinnaa idin kala soocay
idinka iyo Ilaahiinna, oo dembiyadiinnaa wejigiisa idinka
qariyey, oo saasuusan idiin maqlin. 3 Waayo, gacmihiinnii
dhiig bay ku nijaasaysan yihiin, oo farihiinniina xumaan bay
ku nijaasaysan yihiin, bushimihiinnii been bay ku hadleen,
oo afkiinniina shar buu ku guryamaa. 4 Ninna si xaq ah
uma dacweeyo, oo midnaba run kuma muddaco. Waxay
isku halleeyaan waxaan waxba ahayn, oo been bay ku
hadlaan, belaayay uuraystaan, oo xumaan bay dhalaan.
5 Waxay dillaaciyaan jilbis ukuntiis, oo waxay sameeyaan
xuub caaro. Kii ukuntooda cunaaba wuu dhintaa, oo tii
jabtaba jilbis baa ka soo baxa. 6 Xuubabkoodu dhar uma
ay noqon doonaan, oo shuqulladoodana innaba iskuma
qarin doonaan. Shuqulladoodu waa shuqullo xumaaneed,
oo falinta dulmiguna gacmahooday ku jirtaa. 7 Cagahoodu
shar bay u ordaan, oo waxay u degdegaan inay dhiig aan
xaq qabin daadiyaan. Fikirradoodu waa fikirro xumaaneed,
baabba' iyo halligaad ayaa jidadkooda dhex yaal. 8 Jidka
nabadda ma yaqaaniin, oo socodkoodana caddaalad laguma
arko. Waxay samaysteen dhabbayaal qalqalloocan, oo ku
alla kii maraaba nabad ma uu yaqaan. 9 Sidaas daraaddeed
caddaaladu way inaga fog tahay, oo xaqnimana innaba ina
soo gaadhi mayso. Waxaynu sugnaa nuur, laakiinse waxaynu
aragnaa gudcur, oo waxaynu sugnaa iftiin laakiinse madow
baynu ku dhex soconnaa. 10 Sida kuwa indhaha la' ayaynu
derbiga u haabhaabannaa, oo sida innagoo aan innaba
indho lahayn ayaynu wax u haabhaabannaa. Sida fiid oo kale
ayaynu hadh cad u turunturoonnaa, oo waxaynu nahay sida
dad dhintay oo kuwa barwaaqaysan ku dhex jira. 11 Kulligeen
sida orsooyin oo kale ayaynu u cabaadnaa, oo sida qoolleyo
oo kale ayaynu u baroorannaa. Waxaynu sugnaa caddaalad,
laakiinse lama arko, oo waxaynu sugnaa badbaado,
laakiinse way inaga fog tahay. 12 Waayo, Rabbiyow,
xadgudubyadayadii hortaaday ku bateen, oo waxaa nagu
marag fura dembiyadayada, waayo, xadgudubyadayadu way
nala jiraan, oo xumaatooyinkayagana waannu og nahay.
13 Waynu xadgudubnay oo Rabbiga been ka sheegnay
oo Ilaaheen ka leexannay, innagoo dulmi iyo fallaago ku
hadlayna oo erayo been ah uuraysanayna oo qalbiga
kaga hadlayna. 14 Caddaaladdii dib bay u noqotay, oo
xaqnimaduna meel fog bay taagan tahay, waayo, runtii
jidkay ku dhex dhacday, oo qummanaantuna sooma geli
karto. 15 Hubaal runta waa la waayayaa, oo ku alla kii
sharka ka tagaaba wuxuu iska dhigaa wax la boobo, oo
Rabbiguna taas wuu arkay, shar bayna u ahayd inaan
caddaalad la arag. 16 Wuxuuna arkay inaan ninna la
arag, oo inaan dhexdhexaadiye la arag wuu ka yaabay,
sidaas daraaddeed gacantiisa ayaa isaga badbaado u
keentay, oo xaqnimadiisii ayaa tiirisay. 17 Sida laabdhawr
oo kale ayuu xaqnimo u soo xidhay, oo madaxana wuxuu
saartay koofiyad badbaado ah, oo wuxuu dhar ahaan u
guntaday aarsasho, oo qiiro kulul ayuu soo huwaday. 18
Siday falimahoodu istaahilaan ayuu nacabyadiisa cadho
ugu abaalmarin doonaa, oo cadaawayaashiisana wuu u
abaalgudi doonaa, oo gasiiradahana abaalgud buu siin
doonaa. 19 Markaasaa magaca Rabbiga xagga galbeed

lagaga cabsan doonaa, oo ammaantiisana xagga qorrax-ka-
soobaxaa lagaga cabsan doonaa. Marka cadowgu sida daad
oo kale u yimaado ayaa Ruuxa Rabbigu eryi doonaa. **20**
Rabbigu wuxuu leeyahay, Bixiye baa u iman doona Siyoon
iyo kuwa reer Yacquub ee xadgudubka ka leexdaba. **21**
Rabbigu wuxuu leeyahay, Kanu waa axdigayga aan iyaga la
dhigan doono. Ruuxayga ku kor jooga iyo erayadaydii aan
afkaaga ku riday innaba afkaaga, iyo afka farcankaaga, iyo
afka farcankaaga farcankiisa toona hadda ka dib iyo tan iyo
weligeedba kama tegi doonaan, ayaa Rabbigu leeyahay.

**60** Sare joogso, oo dhalaal, waayo, iftiinkaagii waa yimid,
oo ammaantii Rabbiguna way soo baxday oo ku
iftiimisay. **2** Waayo, bal ogow, dhulka gudcur baa dabooli
doona, oo dadyowgana mugdi dam ah ayaa qarin doona,
laakiinse Rabbigaa soo bixi doona oo ku iftiimin doona, oo
ammaantiisana korkaagaa lagu arki doonaa. **3** Oo quruumo
baa iftiinkaaga u iman doona, oo boqorrona waxay u iman
doonaan dhalaalka sarakiciddaada. **4** Bal indhahaaga kor u
qaad oo hareerahaaga fiiri. Intay isa soo wada urursadaan
ayay kuu yimaadaan. Wiilashaadii meel fog bay ka iman
doonaan, oo gabdhahaagana gacmahaa lagu soo qaadi
doonaa. **5** Markaasaad arki doontaa oo nuuri doontaa,
oo qalbigaaguna farxad buu la gariiri doonaa, wuuna
rayrayn doonaa, waayo, badda maalkeeda badan adigaa
laguu soo leexin doonaa, oo hodantinimada quruumahuna
adigay kuu iman doontaa. **6** Waxaa kuu badan doona
awr iyo qaalmihii reer Midyaan iyo reer Ceefah, kulligood
waxay ka iman doonaan Shebaa, oo waxay keeni doonaan
dahab iyo foox. Rabbiga ammaantiisana waa la naadin
doonaa. **7** Adhyaha reer Qedaar oo dhammuna adigay
kugu soo wada ururi doonaan, oo wananka Nebayodna
waxay noqon doonaan wax laguugu adeego, meeshayda
allabariga dusheeda way iman doonaan, iyagoo la aqbalo,
oo gurigayga ammaanta leh waan ammaani doonaa. **8**
Waa kuwee kuwan u duulaya sida daruur oo kale, iyo sida
qoolleyo buulalkooda u duulaya? **9** Hubaal gasiiraduhu
anigay i sugi doonaan, oo doonniyaha Tarshiish ayaa marka
hore iman doona inay wiilashaadii meelo fog ka keenaan
iyagoo lacagtoodii iyo dahabkoodiiba wata, oo waxay u
iman doonaan magaca Rabbiga ah Ilaahaaga iyo Kan
Quduuska ah ee reer binu Israa'iil aawadiis, maxaa yeelay,
isagu wuu ku ammaanay. **10** Oo derbiyadaada waxaa
dhisi doona shisheeyayaal, oo boqorradooduna adigay kuu
adeegi doonaan, waayo, cadhadayda aawadeed ayaan wax
kuugu dhuftay, laakiinse raallinimadayda aawadeed ayaan
kuugu naxariistay. **11** Weliba irdahaagu had iyo goorba
way furnaan doonaan, oo habeen iyo maalin toona lama
xidhi doono in laguu keeno hodantinimada quruumaha
iyo boqorradooda la kaxaystay. **12** Waayo, quruuntii iyo
boqortooyadii aan kuu adeeginuba way halligmi doonaan,
hubaal quruumahaas waa la wada baabbi'in doonaa. **13**
Waxaa kuu iman doonta quruxdii Lubnaan, taasoo ah
geedaha la yidhaahdo beroosh, iyo tidhaar, iyo te'ashuurba
si ay u qurxiyaan meeshayda quduuska ah, oo meesha
cagahayga waxaan ka dhigi doonaa mid ammaan badan. **14**
Oo kuwii ku dhibi jiray wiilashooda ayaa kuu iman doona
iyagoo ku hor foororsanaya, kuwii ku quudhsan jiray oo
dhammuna cagahaaga hortooday ku wada sujuudi doonaan,
oo waxay kugu magacaabi doonaan, Magaaladii Rabbiga,
oo ah Siyoontii Kan Quduuska ah ee reer binu Israa'iil.
**15** In kastoo lagaa tegey oo lagu necbaaday, oo uusan
ninna ku dhex mari jirin, waxaan kaa dhigi doonaa sharaf
weligeed ah iyo farxadda dadka qarniyada badan. **16** Oo
waxaad nuugi doonta caanaha quruumaha, oo waxaad nuugi
doontaa naasaha boqorrada, oo waxaad ogaan doontaa
inaan anigoo Rabbiga ahu ahay Badbaadiyahaaga, iyo
Bixiyahaaga, iyo Kan xoogga badan ee reer Yacquub. **17**
Meeshii naxaasta dahab baan ka keeni doonaa, meeshii
birtana lacag baan ka keeni doonaa, meeshii qorigana
naxaas baan ka keeni doonaa, oo meeshii dhagaxantana bir
baan ka keeni doonaa, oo saraakiishaadana waxaan ka
dhigi doonaa kuwa nabdeed, oo kuwa kuu taliyana waxaan
ka dhigi doonaa kuwa xaqa ah. **18** Dalkaaga mar dambe
dulmi lagama maqli doono, oo baabbi'id iyo halligaadna
soohdimahaaga dhexdooda laguma arki doono, laakiinse
derbiyadaada waxaad ugu yeedhi doontaa Badbaado,
irdahaagana Ammaan. **19** Mar dambe qorraxdu kuuma
ahaan doonto iftiinkaaga maalinnimo, oo dayaxuna nuur
dhalaalaya kuma siin doono, laakiinse Rabbiga ayaa iftiin
weligiis ah kuu ahaan doona, oo Ilaahaaguna qurux buu
kuu ahaan doonaa. **20** Qorraxdaadu mar dambe ma dhici
doonto, oo dayaxaaguna iftiinkiisa ma ceshan doono, waayo,
Rabbigu wuxuu kuu ahaan doonaa iftiin weligiis ah, oo
wakhtigii baroorashadaaduna wuu dhammaan doonaa. **21**
Oo weliba dadkaaga oo dhammuna waxay ahaan doonaan
kuwa xaqa ah, oo weligoodba dalkay dhaxli doonaan, iyagoo
ah laantii beeriddayda, iyo shuqulkii gacmahayga inaan
ammaanmo aawadeed. **22** Mid yarba wuxuu noqon doonaa
kun, oo mid yarna wuxuu noqon doonaa quruun xoog badan.
Anigoo Rabbiga ah ayaa waxan wakhtigiisa soo deddejin
doona.

**61** Ruuxii Sayidka Rabbiga ah ayaa i dul jooga, waayo,
wuxuu Rabbigu ii subkay inaan war wanaagsan
masaakiinta ku wacdiyo, wuxuuna ii soo diray inaan kuwa
qalbiga jaban bogsiiyo, iyo inaan maxaabiista xornimada
ogeysiiyo, kuwa xidhanna furriinnimada, 2 iyo inaan dadka
ogeysiiyo sannadda qaabbilaadda ah ee Rabbiga iyo
maalintii aarsashada Ilaahayaga, iyo inaan kuwa baroorta
oo dhan u qalbi qaboojiyo, 3 iyo inaan kuwa Siyoon ku
baroorta meeshii dambaska qurux madaxooda ka saaro,
oo meeshii baroorashadana aan saliiddii farxadda ka siiyo,
oo meeshii qalbijabna aan dharkii ammaanta ka siiyo, in
iyaga lagu magacaabo geedihii xaqnimada iyo beeriddii
Rabbiga, si uu isagu u ammaanmo. 4 Iyagu waxay dhisi
doonaan burburkii hore, oo waxay kor u taagi doonaan
wixii waa hore dumay, oo waxay cusboonayn doonaan
magaalooyinkii burburay iyo wixii qarniyo badan baabba'
ahaan jiray. 5 Oo shisheeyayaalna halkaasay joogi doonaan
adhigiinnay daajin doonaan, oo kuwa qariibka ahuna waxay
idiin noqon doonaan beerfalayaal iyo kuwa beercanabka ka
shaqeeya. 6 Laakiinse idinka waxaa laydinku magacaabi
doonaa wadaaddadii Rabbiga, oo dadku waxay idiinku
yeedhi doonaan midiidinnadii Ilaahayaga. Waxaad cuni
doontaan maalka quruumaha, oo sharaftooda ayaad ku faani
doontaan. 7 Meeshii ceebtiinna sharaf labanlaab ah baad ka
heli doontaan, oo meeshii qasmiddana waxay ku rayrayn
doonaan qaybtooda, sidaas daraaddeed iyagu dalkooda
qayb labanlaab ah bay ku hantiyi doonaan, oo waxaa iyaga
u ahaan doonta farxad weligeed ah. 8 Waayo, anigoo
Rabbiga ahu caddaalad baan jeclahay, waxdhicidda iyo
xumaantase waan nebcahay. Si daacad ah ayaan iyaga ugu
abaalgudi doonaa, oo waxaan la dhigan doonaa axdi weligiis
ah. 9 Oo farcankoodana quruumahaa lagu dhex aqoon
doonaa, oo carruurtoodana dadyowga dhexdoodaa lagu
aqoon doonaa, oo wax alla wixii iyaga arka oo dhammuba
way aqoonsan doonaan inay iyagu yihiin farcankii Rabbigu
barakeeyey. 10 Si weyn baan Rabbiga ugu rayrayn doonaa,
oo naftayduna Ilaahayga bay ku farxi doontaa, waayo, wuxuu
ii xidhay dharkii badbaadada, oo wuxuu i huwiyey khamiiskii
xaqnimada, sida aroos dharkiisa quruxdasan isku sharraxa
iyo sida aroosad jowharadaheeda isku soo sharraxda. 11
Waayo, sida dhulku biqilkiisa u soo bixiyo, iyo sida beertu
wixii lagu dhex abuuray u soo bixiso, ayaa Sayidka Rabbiga
ahu ka dhigi doonaa in xaqnimo iyo ammaanu ay quruumaha
oo dhan ka soo hor baxaan.

**62** Jeeray xaqnimadeedu sida nuur u soo dhalaasho,
oo ay badbaadadeeduna sida laambad baxaysa u
soo dhalaasho, anigu Siyoon daraaddeed aamusi maayo,
oo innaba Yeruusaalem daraaddeed nasan maayo. 2 Oo
quruumuhu xaqnimadaaday arki doonaan, oo boqorrada oo
dhammuna sharaftaaday arki doonaan, oo waxaa laguu bixin
doonaa magac cusub oo Rabbiga afkiisu kugu magacaabi
doono. 3 Oo weliba waxaad gacanta Rabbiga ku noqon
doontaa taaj qurux ah, iyo cigaal boqornimo. 4 Mar dambe
laguuguma yeedhi doono Tii la dayriyey, oo dalkaagana
mar dambe looguma yeedhi doono Dhulka baabba'a ah,
laakiinse waxaa lagugu magacaabi doonaa Xefsiibaah,
oo dalkaagana waxaa lagu magacaabi doonaaBecuulaah,
waayo, Rabbigu waa kugu farxaa, oo dalkaagana waa la
guursan doonaa. 5 Waayo, sida barbaar inan bikrad ah u
guursado oo kale ayaa wiilashaadu kuu guursan doonaan,
oo sida ninkii aroos ahu uu aroosadda ugu farxo oo kale
ayaa Ilaahaagu kuugu farxi doonaa. 6 Yeruusaalemay,
derbiyadaada waxaan dul saaray waardiyayaal, oo iyana
habeen iyo maalin toona ma ay aamusi doonaan. Kuwiinna
Rabbiga xusuustow, ha aamusina, 7 oo isaga ha nasinina
jeeruu Yeruusaalem dhiso oo ammaan dhulka kaga dhigo, 8
Rabbigu wuxuu ku dhaartay gacantiisa midig iyo dhudhunkiisa
xoogga badan oo yidhi, Hubaal mar dambe hadhuudhkaaga
cadaawayaashaada ma aan siin doono inuu cunto u noqdo,
oo shisheeyayaalna mar dambe ma ay cabbi doonaan
khamrigaagii aad ku hawshootay. 9 Laakiinse kuwii soo
urursaday ayaa cuni doona, oo Rabbiga ayay ammaani
doonaan, oo kuwii canabka soo urursaday ayaa barxadaha
meeshayda quduuska ah khamriga ku cabbi doona. 10
Dhex mara, irdaha dhex mara, oo dadka jidkiisa hagaajiya.
Jidka weyn dhisa, dhisa. Dhagaxyada ka wareejiya, oo
dadyowga calan u taaga. 11 Bal eega, Rabbigu wuxuu
tan iyo dhulka darafkiisa ku naadiyey oo yidhi, Magaalada
Siyoon waxaad ku tidhaahdaan, Bal eeg, badbaadadaadii
waa soo socotaaye. Bal eeg, isagu abaalgudkiisii wuu wataa,
oo abaalmarintiisuna way ka soo horraysaa. 12 Waxaa loogu
yeedhi doonaa, Dadka quduuska ah iyo Kuwa Rabbigu
soo furtay, oo waxaa lagugu magacaabi doonaa, Tii la
doondoonay, iyo Magaalo aan la dayrin.

**63** Yuu yahay kan Edom ka soo socda oo dharka cas
Bosraah kala imanaya? Kan dharkiisa ku quruxda
badan oo weynaanta xooggiisa ku soo socda waa kuma?
Waa anigan xaqnimada ku hadla oo inaan wax badbaadiyo
u xoogga badan. 2 Bal maxaa dharkaagu u cas yahay,
oo lebbiskaagana maxaa loo moodaa sida dharka kan
macsarada canabka ku joogjoogsada? 3 Keligay baan
macsarada ku tuntay, oo dadkiina qofna igalama joogin,

waxaan iyaga kula tuntay cadhadayda, oo waxaan kula
joogjoogsaday xanaaqayga, oo dhiiggooduna lebbiskayguu
ku firidhsan yahay, dharkayga oo dhanna waan ku wada
wasakheeyey. 4 Waayo, maalintii aarsashadu qalbigaygay
ku jirtay, oo kuwaygii aan furtay sannaddoodu waa timid. 5
Waan doondoonay, laakiinse mid i caawiya lama arag, oo
inaan la arag mid i tiiriya waan ka yaabay, sidaas daraaddeed
gacantayda qudheeda ayaa badbaado ii keentay, waxaana
i tiirisay cadhadaydii. 6 Oo dadyowgaan cadhadayda
kula tuntay, xanaaqaygana waan ku sakhraamiyey, oo
dhiiggoodana dhulkaan ku soo daadiyey. 7 Waxaan soo
xusuusanayaa Rabbiga raxmaddiisii iyo Rabbiga ammaantiisii
si waafaqsan waxyaalihii Rabbigu na siiyey oo dhan,
iyo wanaaggii weynaa oo uu reer binu Israa'iil siiyey,
kaasoo uu iyaga u siiyey si waafaqsan naxariistiisa, iyo si
waafaqsan raxmaddiisa faraha badan. 8 Waayo, wuxuu
yidhi, Hubaal iyagu waa dadkayga iyo wiilashayda aan been
ku macaamiloon, oo sidaas daraaddeed ayuu Badbaadiye
ugu noqday. 9 Dhibaatadoodii oo dhan ayuu isna ku
dhibaatooday, oo waxaa iyagii badbaadisay malaa'igta
hortiisa joogta, oo wuxuu iyagii ku soo furtay jacaylkiisii
iyo naxdintiisii, oo isna wuu soo xambaaray, oo waayihii
hore oo dhanna wuu siday. 10 Laakiinse way caasiyoobeen,
oo Ruuxiisa Quduuska ahna way calool xumeeyeen, oo
sidaas daraaddeed ayuu ugu rogmaday inuu cadowgoodii
noqdo, wuuna la diriray. 11 Markaas dadkiisii waxay soo
xusuusteen waayihii hore ee Muuse, oo waxay yidhaahdeen,
Meeh kii badda ka soo gudbiyey iyagii iyo adhijirkii idihiisa?
Meeh kii Ruuxiisa Quduuska ah dhexdooda dhigay, 12
kii dhudhunkiisa ammaanta badan gacanta midigta ee
Muuse raacsiiyey, oo biyaha hortooda ku kala qaybiyey,
inuu magac weligiis ah samaysto? 13 Meeh kii moolka
dhexdiisa ku soo hor kacay sidii faras cidlada dhex maraya
si ayan u turunturoon? 14 Sidii lo' dooxada hoos ugu
dhaadhacaysa ayaa Ruuxa Rabbigu iyaga u nasiyey. Oo
sidaas oo kalaad dadkaagii u hoggaamisay inaad magac
ammaan badan samaysatid. 15 Bal samada wax ka soo
fiiri, oo bal rugtaada quduusnimada iyo ammaanta leh wax
ka soo arag. Meeyey qiiradaadii iyo xooggaagii? Jacaylkii
iyo raxmaddii aad ii qabtay way iga joogsadeen. 16 In
kastoo Ibraahim aanu na garan oo reer binu Israa'iilna
ayan na aqoonsan adigu waxaad tahay aabbahayaga.
Rabbiyow, waxaad tahay aabbahayaga, oo magacaaguna
weligiisba waa Bixiyahayaga. 17 Rabbiyow, bal maxaad
nooga dhigtay inaannu jidkaaga ka qaldanno, maxaadse
qalbigayaga u qallafisay si aannan kaaga cabsan? U soo noqo
addoommadaada aawadood iyo qabiilooyinkii dhaxalkaaga
aawadood? 18 Wakhti yar keliya ayaa dadkaagii quduusanaa
dalkii hanti ahaan u haysteen. Cadaawayaashayadii ayaa
meeshaadii quduuska ahayd ku tuntay. 19 Oo annana
waxaannu kula mid noqonnay sidii kuwa aadan weligaa u
talin, iyo sidii kuwa aan magacaaga loogu yeedhin.

**64** Maad samooyinka soo jeexdid, oo maad hoos u soo
dhaadhacdid, si ay buuruhu hortaada uga gariiraan
2 sida dab xaabo uu u gubo oo uu biyahana u karkariyo,
in magacaaga cadaawayaashaada la ogeysiiyo, iyo in
quruumuhu ay hortaada ku gariiraan! 3 Markaad waxyaalo
cabsi badan oo aannan filanayn samaysay, hoos baad u soo
dhaadhacday, oo buurihiina hortaaday ku gariireen. 4 Tan
iyo waa hore ninna ma garan, dheguna ma maqal, iluna
ma arag Ilaah aan adiga ahayn oo u shaqeeya kan isaga
wax ka suga. 5 Kan isagoo faraxsan xaqnimo sameeya, iyo
kuwa jidadkaaga kugu xusuusta waad la kulantaa. Waad
cadhaysnayd, waannuna dembaabnay. Dembiyadaas wakhti
dheer baannu ku sii soconnay, haddaba ma nala badbaadin
doonaa? 6 Waayo, kulligayo waxaannu noqonnay sida wax
aan nadiif ahayn, oo xaqnimadayada oo dhammuna waa
sida dhar wasakh ah, kulligayona waxaannu u engegnay sida
caleen oo kale, oo xumaantayadiina sidii dabayl oo kale ayay
noo kaxaysataa. 7 Oo innaba lama arko mid magacaaga
ku baryootama, ama niyadiisa u kiciya inuu ku xagsado,
waayo, wejigaagii waad naga qarisay, oo xumaatooyinkayagii
aawadood waad na wada baabbi'isay. 8 Laakiinse haatan,
Rabbiyow, waxaad tahay Aabbahayaga. Annagu waxaannu
nahay dhoobadii, oo adiguna dheryasameeyahayaga baad
tahay, oo annana kulligayo shuqulkii gacantaada baannu
nahay. 9 Rabbiyow, aad ha u cadhoon, oo xumaantana
ilaa weligaa ha sii xusuusan. Bal eeg, oo na fiiri, waan ku
baryaynaaye, waayo, kulligayo dadkaaga baannu nahay.
10 Magaalooyinkaagii quduuska ahaa cidlo bay noqdeen,
Siyoon waxay noqotay cidlo oo kale, Yeruusaalemna waxay
noqotay meel baabba' ah. 11 Gurigayagii quduuska ahaa
oo qurxoonaa oo ahaa meeshii ay awowayaashayo kugu
ammaani jireen dab baa lagu gubay, oo waxyaalahayagii
wanwanaagsanaa oo dhanna waa la wada baabbi'iyey. 12
Rabbiyow, waxyaalahaas aawadood ma isu celinaysaa? Ma
iska aamusaysaa, oo ma aad baad noo sii dhibaysaa?

**65** Waxaan aqbalay kuwa aan wax i weyddiinayn, oo
waxaa i helay kuwa aan i doondoonayn. Waxaa quruun
aan magacayga loogu yeedhi jirin ku idhi, I eeg, i eeg. 2
Maalintii oo dhan waxaan gacmahayga u kala bixinayay dad
caasi ah, oo jid aan wanaagsanayn ku socda, oo fikirradooda
daba gala, 3 oo ah dad had iyo goorba badheedh iiga

cadhaysiiya, iyagoo beero allabari ku bixiya, oo meelo
leben laga sameeyey foox ku shida. **4** Waxay fadhiyaan
xabaalaha dhexdooda, oo meelo qarsoon bayna ku hoydaan.
Hilib doofaar bay cunaan oo weelashoodana waxaa ku
jira maraq waxyaalo karaahiyo ah laga sameeyey, **5** oo
waxay yidhaahdaan, Goonidaada u taagnow, oo ha ii soo
dhowaanin, waayo, waan kaa quduusanahay. Kuwaasu waa
qiiq sanka iga galay, iyo dab maalinta oo dhan qaxmaya. **6**
Bal eega, tanu hortayday ku qoran tahay, Anigu iska aamusi
maayo, laakiinse waan abaalmarin doonaa, oo waxaan
abaalmarinta gelin doonaa laabtooda. **7** Xumaatooyinkiinnii
iyo xumaatooyinkii awowayaashiinba isku mar baan idiinka
abaalmarin doonaa, ayaa Rabbigu leeyahay, waayo, iyagu
buurahay foox ku shideen oo kurahay igu caayeen, sidaas
daraaddeed laabtooda ayaan shuqulladoodii hore gelin
doonaa. **8** Rabbigu wuxuu leeyahay, Sida khamriga looga
helo rucubka canabka dhexdiisa, oo mid u yidhaahdo, Ha
hallaynin, waayo, barakaa ku dhex jirta, sidaas oo kalaan
u samayn doonaa addoommadayda aawadood, si aanan
dhammaantood u wada baabbi'in. **9** Waxaan reer Yacquub
ka soo bixin doonaa farcan, oo Yahuudahna waxaan ka
soo bixin doonaa mid buurahayga dhaxla, oo kuwayga
aan doortay ayaa dhaxli doona, oo addoommadayda ayaa
halkaas degi doona. **10** Shaaroon waxay noqon doontaa
meel ay adhiyuhu daaqaan, oo dooxadii Caakoorna waxay
noqon doontaa meel ay lo'yowgu fadhiistaan, dadkayga i
doondoonay aawadood. **11** Laakiinse kuwiinna Rabbiga ka
taga, oo buurtayda quduuska ah illoobay, oo Gaad miis
u diyaariya, oo Menii khamri u qasa, **12** waxaan idinka
dhigi doonaa kuwa seefta ku le'da, oo dhammaantiinna
waxaad u wada foororsan doontaan in laydin gowraco,
maxaa yeelay, markaan idiin yeedhay iima aydaan jawaabin,
oo markaan idinla hadlayna, ima aydaan maqlin, laakiinse
wax indhahayga hortooda shar ku ahaa baad samayseen,
oo waxaad doorateen wax aanan ku farxin. **13** Sidaas
daraaddeed Sayidka Rabbiga ahu wuxuu leeyahay, Bal
ogaada, addoommadaydu wax bay cuni doonaan, idinkuse
waad gaajaysnaan doontaan, addoommadaydu wax bay
cabbi doonaan, idinkuse waad harraadsanaan doontaan,
addoommadaydu way rayrayn doonaan, idinkuse waad
ceeboobi doontaan, **14** addoommadaydu farxadda qalbigooda
ayay la gabyi doonaan, idinkuse murugta qalbigiinna ayaad
la ooyi doontaan, oo dhibta ruuxiinna ayaad la barooran
doontaan. **15** Oo magiciinna ayaad kuwayga aan doortay ugu
dayn doontaan, inuu habaar lagu dhaarto u noqdo, oo Sayidka
Rabbiga ah ayaa idin layn doona, oo addoommadiisana
magac kaluu u bixin doonaa. **16** Kii isagoo dalka jooga
isu duceeyaa wuxuu isugu ducayn doonaa Ilaaha runta,
oo kii isagoo dalka jooga dhaartaana wuxuu ku dhaaran
doonaa Ilaaha runta, waayo, dhibaatooyinkii hore waa la
illoobay, indhahaygana way ka qarsoon yihiin. **17** Waayo,
bal eega, waxaan abuuri doonaa samooyin cuscusub iyo
dhul cusub, oo waxyaalihii horena lama soo xusuusan
doono, oo innaba maanka sooma ay geli doonaan. **18**
Laakiinse farxa oo weligiinba waxa aan abuuro ku reyreeya,
waayo, bal eega, Yeruusaalem waxaan u abuuraa rayrayn,
dadkeedana farxad baan u abuuraa. **19** Oo Yeruusaalem
baan ku rayrayn doonaa, oo dadkaygana waan ku farxi
doonaa, oo codkii oohinta iyo codkii baroorashadana mar
dambe dhexdeeda lagama maqli doono. **20** Oo markaas
dabadeedna innaba dhexdeeda ilmo dhawr maalmood
jira, amase oday aan cimrigiisa dhammaysan lagama heli
doono, waayo, ilmuhu wuxuu dhiman doonaa isagoo boqol
sannadood jira, dembilaha boqol sannadood jirase wuxuu
ahaan doonaa mid inkaaran. **21** Guryay dhisan doonaan,
wayna degi doonaan, oo beero canab ahna way beeran
doonaan, midhahoodana way cuni doonaan. **22** Si uu mid kale
u dego, guryo ma ay dhisi doonaan, oo si uu mid kale u cuno,
beero ma ay beeran doonaan, waayo, dadkayga cimrigiisu
wuxuu ahaan doonaa sidii geed cimrigiis, oo kuwayga aan
doortayna wakhti dheer ayay shuqulka gacmahooda ku
farxi doonaan. **23** Si aan waxba tarin uma ay hawshoon
doonaan, oo masiibona carruur uma ay dhali doonaan,
waayo, iyagu waa farcankii kuwii Rabbigu barakeeyey, iyaga
iyo carruurtoodaba. **24** Intaanay dhawaaqin ayaan u jawaabi
doonaa, oo intay weli hadlayaan ayaan maqli doonaa. **25**
Yeyda iyo baraarku way isla wada daaqi doonaan, libaaxuna
sida dibi oo kale caws buu u cuni doonaa, oo boodhkuna
abeesada quudkeeduu ahaan doonaa. Rabbigu wuxuu
leeyahay, Buurtayda quduuska ah oo dhan waxba kuma
yeeli doonaan, waxna kuma baabbi'in doonaan.

**66** Rabbigu wuxuu leeyahay, Samadu waa carshigayga,
dhulkuna waa meeshaan cagaha saarto. Guri
caynmaad ii dhisi doontaan? Oo maxay tahay meeshaan
ku nastaa? **2** Waayo, waxyaalahan oo dhan gacantaydaa
samaysay, oo waxyaalahan oo dhammuna way wada
ahaadeen, ayaa Rabbigu leeyahay, laakiinse ninkan waan
fiirinayaa kaasoo ah miskiin, ruuxiisuna jaban yahay,
eraygaygana ka gariira. **3** Kii dibi gowracaa wuxuu la mid
yahay mid nin dilay oo kale, kii wan yar allabari ahaan u
bixiyaana wuxuu la mid yahay mid eey qoorta ka jebiya
oo kale, oo kii qurbaan bixiyaana wuxuu la mid yahay
sida isagoo doofaar dhiiggiis bixiya oo kale, oo kii foox

shidaana wuxuu la mid yahay sida isagoo sanam ammaana.
Hubaal waxay doorteen jidadkooda, oo naftooduna waxay ku
faraxdaa karaahiyadooda. 4 Anna waxaan dooran doonaa
dhibaatooyinkooda, oo waxay ka cabsadaanna waan ku
soo kor dayn doonaa, maxaa yeelay, markaan u yeedhay,
innaba cidina iima jawaabin, oo markaan la hadlayna, ima
ay maqlin, laakiinse wax indhahayga hortooda shar ku
ahaa bay sameeyeen, oo waxay doorteen wax aanan ku
farxin. 5 Kuwiinna eraygiisa ka gariirow, bal erayga Rabbiga
maqla. Walaalihiinna idin neceb, oo magacayga aawadiis
idiin xoora, waxay yidhaahdeen, Rabbiga ha la ammaano, si
aan farxaddiinna u aragno, laakiinse iyagu way ceeboobi
doonaan. 6 Buuq baa magaalada laga maqlayaa, cod
baana macbudka ka yeedhaya, waana codka Rabbiga oo
cadaawayaashiisii abaalmarinaya. 7 Intii ayan foolan ayay
dhashay, oo intii ayan xanuunsan ayay wiil umushay. 8
Bal yaa waxaas oo kale maqlay? Yaase waxaas oo kale
arkay? Dal miyuu maalin qudha dhashaa? Quruunse miyey
haddiiba dhalataa? Waayo, Siyoon mar alla markay foolatay
ayay haddiiba carruurteedii dhashay. 9 Rabbigu wuxuu
leeyahay, Anigoo foosha keena miyaanan dhalin doonin?
Ilaahaagu wuxuu leeyahay, Anigoo wax dhaliya, miyaan
maxalka awdi doonaa? 10 Kuwiinna iyada jecel oo dhammow,
Yeruusaalem la reyreeya, oo aawadeed u faraxsanaada,
kuwiinna u baroorta oo dhammow, farxad aawadeed ula
reyreeya, 11 si aad naaseheeda gargaarka ah u nuugtaan
oo aad uga dheregtaan, iyo si aad sharafteeda badan uga
maashaan oo aad ugu faraxdaan. 12 Waayo, Rabbigu wuxuu
leeyahay, Bal eega, nabad sida webi oo kale ayaan ugu
soo fidin doonaa, oo sharafta quruumahana sida durdur
soo buuxdhaafay oo kale ayaan ugu soo dayn doonaa, oo
markaasaad nuugi doontaan, oo sintaa laydinku xambaari
doonaa, dhabtaana laydinku dul cayaarsiin doonaa. 13 Sida
mid hooyadiis u qalbi qaboojiso oo kale ayaan aniguna idiin
qalbi qaboojin doonaa, oo waxaa laydinku qalbi qaboojin
doonaa Yeruusaalem. 14 Oo markaad waxaas aragtaan ayaa
qalbigiinnu farxi doonaa, oo lafihiinnuna sida caws qoyan oo
kale ayay u soo barwaaqaysnaan doonaan, oo waxaa la
ogaan doonaa inay gacanta Rabbigu addoommadiisa la jirto,
cadhadiisuse waxay ku dhici doontaa cadaawayaashiisa. 15
Waayo, bal eega, Rabbigu wuxuu la iman doonaa dab, iyo
gaadhifardoodyadiisa cirwareenta la moodo, inuu xanaaqiisa
cadho ku keeno canaantiisana dab ololkiis. 16 Waayo,
Rabbigu wuxuu binu-aadmiga oo dhan ku xukumi doonaa
dab iyo seeftiisa, oo kuwa Rabbigu laayana way badan
doonaan. 17 Rabbigu wuxuu leeyahay, Kuwa isdaahiriya,
oo beeraha isku dhex nadiifiya, oo midba midka kale daba
socdo, oo hilibka doofaarka, iyo karaahiyada, iyo jiirka cunaa
dhammaantood way wada baabbi'i doonaan. 18 Waayo,
shuqulladooda iyo fikirradooda waan ogahay, oo waxay
noqon doontaa inaan soo wada ururiyo quruumaha iyo afafka
oo dhanba, oo iyana way iman doonaan, ammaantaydana
way arki doonaan. 19 Oo waxaan dhexdooda ka taagi
doonaa calaamad, oo kuwooda baxsan doonana waxaan u
diri doonaa quruumaha, kuwaasoo ah Tarshiish, iyo Fuul
iyo Luudka qaansada xooda, iyo Tubal iyo Yaawaan, iyo
gasiiradaha fog, oo aan weligood warkayga maqal oo aan
ammaantaydana arag, oo iyana ammaantayday quruumaha
ka dhex sheegi doonaan. 20 Rabbigu wuxuu leeyahay, Waxay
Rabbiga qurbaan ahaan ugu keeni doonaan walaalihiin oo
dhan, oo waxay ka soo kaxayn doonaan quruumaha oo
dhan, iyagoo fuushan fardo, iyo gaadhifardoodyo, iyo sariiro
gacmeed, iyo baqlo, iyo rakuubbo dheereeya, oo waxay
keeni doonaan buurtayda quduuska ah ee Yeruusaalem,
sida reer binu Israa'iil ay weel nadiifsan qurbaankooda
ugu keenaan oo ay guriga Rabbiga u soo geliyaan. 21
Oo Rabbigu wuxuu leeyahay, Weliba waxaan iyaga kala
dhex bixi doonaa wadaaddo iyo kuwa reer Laawi ah. 22
Oo Rabbigu wuxuu leeyahay, Sida samooyinka cuscusub
iyo dhulka cusub oo aan samayn doono ay hortayda ugu
raagi doonaan, ayaa farcankiinna iyo magiciinnuba hortayda
ugu raagi doonaan. 23 Oo Rabbigu wuxuu leeyahay, Waxay
noqon doontaa in bil ka bil iyo sabti ka sabti binu-aadmiga oo
dhammuba ay u iman doonaan inay hortayda igu caabudaan.
24 Oo iyana way bixi doonaan, oo waxay fiirfiirin doonaan
dadkii igu xadgudbay meydadkooda, waayo, dixirigoodu ma
dhiman doono, oo dabkuna kama demi doono, oo waxay
binu-aadmiga oo dhan u noqon doonaan karaahiyo.

# Yeremyaah

**1** Kuwanu waa erayadii Yeremyaah ina Xilqiyaah, oo ka
mid ahaa wadaaddadii joogay Canaatood oo ku tiil dalka
reer Benyaamiin. 2 Waxaa isaga u yimid erayga Rabbiga
wakhtigii uu Yoosiyaah ina Aamoon dalka Yahuudah boqor
ka ahaa, sannaddii saddex iyo tobnaad ee boqortooyadiisa.
3 Oo wuxuu kaloo isaga u yimid wakhtigii Yehooyaaqiim
ina Yoosiyaah uu dalka Yahuudah boqor ka ahaa, iyo ilaa
sannaddii kow iyo tobnaad ee Sidqiyaah ina Yoosiyaah uu
dalka Yahuudah boqor ka ahaa, iyo ilaa waagii Yeruusaalem
maxaabbiisahaanta loo kaxaystay bishii shanaad. 4
Markaasaa eraygii Rabbigu ii yimid, isagoo leh, 5 Intaanan
uurkii hooyadaa kugu abuurin ayaan ku iqiin, oo intaadan
uurka ka soo bixin ayaan quduus kaa dhigay, oo waxaan
kuu doortay inaad nebi u noqotid quruumaha. 6 Markaasaan
idhi, Sayidow, Rabbiyow, bal eeg, anigu ma aan hadli karo,
waayo, dhallinyaraan ahay. 7 Laakiinse Rabbigu wuxuu igu
yidhi, Ha odhan, Dhallinyaraan ahay, waayo, waa inaad u
tagtaa qof kasta oo aan kuu diri doono, oo wax alla wixii aan
kugu amri doonoba waa inaad ku hadashaa. 8 Iyaga ha ka
baqin, waayo, anigu waan kula jiraa inaan ku samatabbixiyo,
ayaa Rabbigu leeyahay. 9 Markaasaa Rabbigu gacanta soo
fidiyey, oo afkayguu taabtay, kolkaasaa Rabbigu wuxuu igu
yidhi, Bal eeg, Anigu erayadaydii ayaan afka kuugu riday.
10 Bal eeg, maantadan ayaan kaa kor yeelay quruumaha
iyo boqortooyooyinkaba, inaad rujisid oo aad dumisid, iyo
inaad baabbi'isid oo aad afgembidid, iyo inaad dhistid oo
aad beertid. 11 Oo weliba eraygii Rabbigu waa ii yimid,
isagoo leh, Yeremyaahow, bal maxaad aragtaa? Oo aniguna
waxaan idhi, Waxaan arkaa ul yicib ah. 12 Markaasaa
Rabbigu igu yidhi, Si fiican baad wax u aragtay, waayo,
eraygaygaan ka fiirsadaa si aan u oofiyo. 13 Oo haddana
mar labaad ayuu eraygii Rabbigu ii yimid, oo wuxuu igu yidhi,
Maxaad aragtaa? Oo aniguna waxaan idhi, Waxaan arkaa
dheri karaya, oo wuxuu ka soo jeedaa xagga woqooyi. 14
Markaasaa Rabbigu igu yidhi, Masiibo ayaa xagga woqooyi
kaga soo kici doonta dadka dalka deggan oo dhan. 15
Waayo, Rabbigu wuxuu leeyahay, Bal eeg, anigu waxaan u
yeedhi doonaa qolooyinka boqortooyooyinka woqooyi oo
dhan, oo iyana way iman doonaan, oo midkood kastaaba
wuxuu carshigiisa dhigan doonaa irdaha Yeruusaalem laga
soo galo, iyagoo ku kacsan derbiyadeeda ku wareegsan oo
dhan, iyo magaalooyinka dalka Yahuudah oo dhan. 16 Oo
anna waxaan kala hadli doonaa xukummadayda ku saabsan
xumaantooda oo dhan, waayo, way iga tageen oo ilaahyo
kale ayay foox u shideen, wayna u sujuudeen shuqulladii ay
gacmahoodu sameeyeen. 17 Haddaba sidaas daraaddeed
guntiga dhexda ku giiji oo sara joogso, oo waxaad iyaga u
sheegtaa wixii aan kugu amro oo dhan, oo yaanan hortooda
kugu nixine innaba wejigooda ha ka nixin. 18 Waayo, bal
eeg, maanta waxaan kaa dhigay magaalo deyr leh, iyo tiir
bir ah, iyo derbiyo naxaas ah, oo dalka oo dhan col ku ah,
oo col ku ah boqorrada dalka Yahuudah, iyo amiirradooda,
iyo wadaaddadooda, iyo dadka dalka oo dhanba. 19 Oo
Rabbigu wuxuu leeyahay, Iyagu way kula diriri doonaan,
laakiinse kaama ay adkaan doonaan, waayo, waan kula jiraa
inaan ku samatabbixiyo.

**2** Oo haddana eraygii Rabbigu waa ii yimid, isagoo leh,
2 Tag oo Yeruusaalem dhegaha kaga qayli, oo waxaad ku
tidhaahdaa, Rabbigu wuxuu leeyahay, Waxaan xusuusnahay
roonaantii yaraantaada iyo jacaylkii doonanaantaada,
markaad igu raaci jirtay cidladii ahayd dal aan waxba lagu
beerin. 3 Reer binu Israa'iil wuxuu Rabbiga u ahaa quduus,
iyo midhihii ugu horreeyey ee beergooyskiisii, oo kuwii
isaga cunay oo dhammu eed bay lahaayeen, oo masiibo
baa iyaga ku soo degtay, ayaa Rabbigu leeyahay. 4 Reer
Yacquub iyo qolooyinka reer binu Israa'iil oo dhammow,
bal maqla erayga Rabbiga: 5 Rabbigu wuxuu leeyahay,
Awowayaashiin maxaa xaqdarro ah oo ay iga heleen oo
ay iiga fogaadeen, oo ay waxyaalaha aan waxtarka lahayn
u raaceen, oo ay waxmatarayaal u noqdeen? 6 Oo iyagu
innaba ma ay odhan, Meeh Rabbigii dalka Masar naga
soo bixiyey, oo nagu soo hor kacay cidlada dhexdeeda,
taasoo ahayd dal lamadegaan ah oo godad badan, iyo dal
abaar iyo hooska dhimashada ah, iyo dal aan ciduna dhex
marin, iyo meel aan la degin? 7 Oo waxaan idin keenay
waddan barwaaqo badan, inaad midhihiisa iyo wanaaggiisa
cuntaan, laakiinse markaad soo gasheen ayaad dalkaygii
nijaasayseen, oo dhaxalkaygiina waxaad ka dhigteen wax
karaahiyo ah. 8 Wadaaddadii ma ay odhan, Rabbigii meeh?
Oo kuwa sharciga hayaana ima ay aqoon, oo taliyayaashiina
way igu xadgudbeen, oo nebiyadiina waxay wax ku sii
sheegeen Bacal, oo waxay iska daba galeen waxyaalo aan
innaba faa'iido lahayn. 9 Oo sidaas daraaddeed weli waan
idinla muddacayaa, oo carruurtiinna carruurtoodana waan la
muddici doonaa. 10 Waayo, bal u gudba xagga gasiiradda
Kitiim, oo bal wax eega, oo xagga Qedaarna cid u dira, oo
aad u fiirsada, oo bal eega hadday waxaas oo kale halkaas
jiraan. 11 Miyey jirtaa quruun beddeshay ilaahyadeed aan
ilaahyo ahayn? Laakiinse dadkaygu waxay ammaantoodii
ku beddeleen wax aan waxtar lahayn. 12 Rabbigu wuxuu
leeyahay, Samooyinkow, bal waxan la yaaba, oo aad iyo aad

u cabsada, oo haddana aad u gariira. 13 Waayo, dadkaygii
laba waxyaalood oo shar ah ayay sameeyeen, way iga
tageen anigoo ah isha biyaha nool, oo waxay qoteen berkedo
daldaloola oo aan innaba biyo celin karin. 14 Dalka Israa'iil
ma addoon baa, mase waa bidde guriga ku dhashay? Maxaa
isaga loo kala boobay? 15 Libaaxyo qayrabyo ah ayaa
ku ciyey, oo codkoodiina way dheereeyeen, oo dalkiisiina
way baabbi'iyeen, oo magaalooyinkiisiina way gubteen oo
ciduna ma deggana. 16 Oo waxaa dhalada kaa jebiyey reer
Nof iyo reer Taxfanees. 17 Sow adiga qudhaadu isuma
aad keenin belaayadan, waayo, waxaad ka tagtay Rabbiga
Ilaahaaga ah markuu jidka kugu hagayay? 18 Oo haatan
bal maxaad ka samaynaysaa jidka Masar inaad cabto
biyaha Shiixoor? Amase bal maxaad ka samaynaysaa jidka
Ashuur inaad cabto biyaha Webi Yufraad? 19 Haddaba
xumaantaada ayaa ku edbin doonta, oo dibunoqoshadaada
ayaa ku canaanan doonta. Sayidka ah Rabbiga ciidammadu
wuxuu leeyahay, Haddaba bal ogow oo arag inay tahay
wax shar ah oo qadhaadh inaad iga tagtay anigoo Rabbiga
Ilaahaaga ah, iyo inaadan iga cabsan. 20 Waayo, waa
hore ayaad harqoodkaagii jebisay, oo waxaad kala gooysay
silsiladihii kugu xidhnaa, oo waxaad tidhi, Anigu kuu adeegi
maayo, oo buur kasta oo dheer korkeed iyo geed kasta oo
doog ah hoostiis ayaad ku jiifsatay sida dhillo oo kale. 21
Laakiin waxaan kuu beeray canab wacan, oo kulligiis abuur
wanaagsan ah, haddaba sidee baad ugu beddelantay inaad
igu noqotid canab ba'ay oo qalaad? 22 Waayo, Sayidka
Rabbiga ahu wuxuu leeyahay, In kastoo aad soodhe isku
maydhid, oo aad saabuun iska badisid, weli xumaantaadii
sida calaamad oo kale bay ii muuqataa. 23 Sidee baad u
odhan kartaa, Anigu ma nijaasoobin, oo Bacaliimna ma
raacin? Bal fiiri socodkii aad dooxada ku martay, oo garo
wixii aad samaysay. Waxaad tahay qaalin geel oo dheeraysa
oo warwareegta, 24 iyo dameerdibadeed cidlada baratay, oo
iyadoo orgoonaysa dabaysha ursanaysa. Yaa damaceeda
ka celin kara? Oo kuwa iyada doonaya oo dhammuna isma
ay daalin doonaan, waayo, iyaday bisheeda heli doonaan.
25 Cagahaaga kabola'aan ka dhawr, oo hungurigaagana
harraad ka dhawr, laakiinse waxaad tidhi, Rajo ma leh
innaba, waayo, waxaan jeclaaday shisheeyayaal, oo iyagaan
iska daba gelayaa. 26 Siduu tuug markii la qabto u ceeboobo
oo kale ayay reer binu Israa'iil u ceeboobeen, iyaga, iyo
boqorradooda, iyo amiirradooda, iyo wadaaddadooda, iyo
nebiyadooduba, 27 kuwaasoo geed ku yidhaahda, Waxaad
tahay aabbahay, oo dhagaxna ku yidhaahda, Adigaa i
dhalay. Dhabarkay ii soo jeediyeen, wejigiina way iga sii
jeediyeen, laakiinse wakhtigii ay dhibaataysan yihiin waxay i
odhan doonaan, Kac oo na badbaadi. 28 Laakiinse meeye
ilaahyadaadii aad samaysatay? Iyagu ha keceen hadday ku
badbaadin karaan wakhtigii aad dhibaataysan tahay, waayo,
dadka Yahuudah ahow, ilaahyadiinnu waxay tiro le'eg yihiin
magaalooyinkiinna. 29 Sidaas daraaddeed Rabbigu wuxuu
leeyahay, Bal maxaad iila muddacaysaan? Waayo, idinku
kulligiin waad iga gudubteen. 30 Anigu waxtarla'aan baan
carruurtiinnii u dilay, iyaguse innaba kuma ay waano qaadan.
Seeftiinnii ayaa nebiyadiinnii baabbi'isay sidii libaax wax
baabbi'inaya oo kale. 31 Dadka qarniganow, bal erayga
Rabbiga ka fiirsada. Reer binu Israa'iil ma waxaan u ahaa
cidlo ama dal gudcur ah? Haddaba bal maxaa dadkaygu
u yidhaahdaan, Xor baannu nahay, oo mar dambe kuu
iman mayno? 32 Gabadhu miyey illoobi kartaa wixii ay isku
sharaxdo, aroosadduse miyey illoobi kartaa wixii ay xidhato?
Laakiinse dadkaygu waxay i illoobeen maalmo badan oo
aan la tirin karin. 33 Sidee baad jidkaaga u hagaajisaa
markaad caashaq doondoonto? Sidaas daraaddeed xataa
naagaha xunxunna jidadkaagaad bartay. 34 Oo weliba
darfaha dharkaagana waxaa laga helaa dhiiggii masaakiinta
aan xaqa qabin, sababtuna ma aha inaad heshay iyagoo
guriga dhacaya, laakiinse waa waxyaalahaas oo dhan
daraaddood. 35 Oo weliba waxaad istidhaahdaa, Anigu xaq
ma qabo. Sida xaqiiqada ah cadhadiisu way iga noqotay. Bal
ogow, anigu waan kula muddici doonaaye, maxaa yeelay,
waxaad tidhaahdaa, Anigu ma aan dembaabin. 36 Maxaad u
warwareegtaa si aad jidadkaaga u beddesho? Ceeb baa
dalka Masar kaaga iman doonta siday dalka Ashuur kaaga
timid oo kale. 37 Oo weliba isagana waad ka soo bixi
doontaa, adigoo gacmahu madaxa kuu saaran yihiin, waayo,
Rabbigu waa diiday kuwa aad ku kalsoon tahay oo dhan, oo
iyaga innaba ku dhex liibaani maysid.

**3** Waxaa la yidhaahdaa, Haddii nin naagtiisa iska furo,
oo ay ka tagto isaga, oo ay nin kale naagtiis noqoto, kii
qabi jiray miyuu iyada u soo noqdaa? Miyaan dalkaasu aad
u nijaasoobayn? Laakiinse adigu waxaad ka dhillaysatay
saaxiibbo badan, oo haddana miyaad ii soo noqon doontaa?
ayaa Rabbigu leeyahay. 2 Bal indhaha kor u qaad oo waxaad
fiirisaa meelaha dhaadheer, oo bal eeg. Miyey jirtaa meel
aan lagula seexan? Adoo iyaga sugaya ayaad jidadka ag
fadhiisatay sidii Carab cidlada jooga, oo waxaad dalkii ku
nijaasaysay dhillanimadaada iyo sharkaagaba. 3 Sidaas
daraaddeed tiixyadii waa la joojiyey, oo roobkii dambena waa
la waayay, weliba waxaad yeelatay dhillo jaaheed, oo inaad
xishootana waad diidday. 4 Haatan sow iguma qayshan,
Aabbahayow, adigu waxaad tahay saaxiibkii yaraantaydii?

5 Miyuu weligiisba sii cadhaysnaan doonaa? Oo miyuu
cadhadiisa ilaa ugudambaysta sii haysanayaa? Bal eeg,
waxaad ku hadashay oo samaysay waxyaalo shar ah in
alla intii aad kartayba. 6 Weliba wakhtigii Boqor Yoosiyaah
Rabbigu wuxuu kaloo igu yidhi, War miyaad aragtay waxa
boqortooyadii Israa'iil ee dib u noqotay ay samaysay?
Iyadu waxay tagtay buur kasta oo dheer dusheed iyo geed
kasta oo doog ah hoostiis, oo halkaasay ku dhillowday.
7 Oo iyadu markay waxyaalahaas oo dhan samaysay
dabadeed ayaan waxaan is-idhi, Way ii soo noqon doontaa,
laakiinse iyadu sooma noqon. Oo walaasheedii boqortooyadii
Yahuudah oo sirreyda ahaydna waxaas way aragtay. 8
Boqortooyadii Israa'iil ee dib u noqotay way sinaysatay,
oo taas daraaddeed ayaan iyadii furay oo waxaan siiyey
warqaddii furniinkeeda, oo waxaan arkay in walaasheedii
Yahuudah oo sirreyda ahayd innaba aanay weli cabsan,
laakiinse iyana ay tagtay oo dhillowday. 9 Oo waxay noqotay
inuu dalkii ku nijaasoobay fudaydkii dhillanimadeeda, oo
iyana way ka sinaysatay dhagxan iyo geedo. 10 Oo Rabbigu
wuxuu leeyahay, Walaasheedii Yahuudah oo sirreyda ahayd
in kastoo ay waxyaalahaas oo dhan aragtay haddana
qalbigeeda oo dhan iiguma ay soo noqon, laakiinse waxay
iigu soo noqotay si isyeelyeelid ah. 11 Oo haddana waxaa
Rabbigu igu yidhi, Boqortooyadii Israa'iil ee dib u noqotay
way iscaddaysay inay ka xaq badan tahay boqortooyada
Yahuudah ee sirreyda ah. 12 Tag, oo erayadan xagga woqooyi
u naadi, oo waxaad tidhaahdaa, Boqortooyada Israa'iil ee
dib u noqotayay, soo noqo, maxaa yeelay, weji cadhaysan
kugu eegi maayo, waayo, waan naxariis badnahay, oo
cadhadaydana weligay sii haysan maayo, ayaa Rabbigu
leeyahay. 13 Waxaa keliya ood aqoonsataa xumaantaada,
inaad Rabbiga Ilaahaaga ah ku xadgudubtay, iyo inaad
geed kasta oo doog ah hoostiisa jidadkaaga ugu kala
firdhisay shisheeyayaasha, iyo inaadan codkaygii addeecin,
ayaa Rabbigu leeyahay. 14 Carruurtii dib u noqotayay,
soo noqda, waayo, waxaan ahay Sayidkiinnii, oo midkiin
waxaan kala soo bixi doonaa magaalo, labana waxaan
kaloo soo bixi doonaa qolo, oo waxaan idin keeni doonaa
Siyoon, ayaa Rabbigu leeyahay. 15 Oo sida qalbigaygu
jecel yahay waxaan idiin siin doonaa daajiyayaal, oo iyana
waxay idinku daajin doonaan aqoon iyo waxgarasho. 16
Rabbigu wuxuu leeyahay, Wakhtigaas markaad tarantaan oo
aad dalka dhexdiisa ku badataan, waxay noqon doontaa
inaan mar dambe la odhan, Sanduuqii axdiga Rabbiga, oo
lagamana fikiri doono, lamana soo xusuusan doono, lamana
soo booqan doono, oo mar dambena lama samayn doono.
17 Oo wakhtigaas waxaa Yeruusaalem lagu magacaabi
doonaa carshigii Rabbiga, oo quruumaha oo dhammuna
iyaday ugu soo wada ururi doonaan magaca Rabbiga
oo Yeruusaalem yaal, oo iyana mar dambe ma ay daba
geli doonaan caasinimada qalbigooda sharka ah. 18 Oo
wakhtigaas dadka Yahuudah waxay la socon doonaan dadka
Israa'iil, oo iyagoo isa soo raaci doona ayay dalka woqooyi
ka soo bixi doonaan, waxayna iman doonaan dalkii aan
awowayaashiin dhaxalka u siiyey. 19 Waxaan idhi, Sidee
baan wiilasha kuu dhex geeyaa, oo aan dal wacan kuu
siiyaa, kaasoo ah dhaxalka ugu wanaagsan ee quruumaha?
Oo haddana waxaan idhi, Waxaad igu yeedhi doontaan,
Aabbahayow, oo igama aad jeesan doontaan. 20 Rabbigu
wuxuu leeyahay, Reer binu Israa'iilow, sida xaqiiqada ah
naag khaa'inad ahu siday ninkeeda uga tagto oo kale ayaad
idinkuna khiyaano igula macaamilooteen. 21 Cod baa ka
yeedhaya meelaha dhaadheer dushooda, waana oohin iyo
baryootankii dadka Israa'iil, waayo, jidkooday qallooc iyeen,
oo waxay iska illoobeen Rabbigii Ilaahooda ahaa. 22
Carruurta dib u noqotayay, soo noqda, oo dibunoqoshadiinna
ayaan bogsiin doonaa. Bal eeg, haatan waannu kuu nimid,
waayo, waxaad tahay Rabbiga Ilaahayaga ah. 23 Sida runta
ah waa rajo been ah in badbaadinta kuraha iyo buuraha
badan laga sugo. Sida runta ah badbaadadii dadka Israa'iil
waxay ka timaadaa Rabbiga Ilaahayaga ah. 24 Laakiinse
tan iyo yaraantayadii waxa ceebta ah ayaa baabba' ka
dhigtay wixii awowayaashayo ku hawshoodeen oo dhan,
xataa adhyahoodii iyo ishkinkoodii, iyo wiilashoodii iyo
gabdhahoodiiba. 25 Ceebtayada aannu la jiifsanno oo
sharafdarradayaduna ha na dul saarnaato, waayo, tan
iyo yaraantayadii iyo ilaa maantadan la joogo annaga iyo
awowayaashayoba waxaannu ku dembaabnay Rabbiga
Ilaahayaga ah, oo codkii Rabbiga Ilaahayaga ahna ma
aannu addeecin.

4 Rabbigu wuxuu leeyahay, Dadka Israa'iilow, haddaad
soo noqotaan, waa inaad xaggayga u soo noqotaan, oo
haddaad karaahiyadiinna hortayda ka fogaysaanna innaba
laydin dhaqdhaqaajin maayo. 2 Oo haddaad si run iyo
caddaalad iyo xaqnimo ah ugu dhaarataan, Rabbigu waa
nool yahay, de markaas quruumuhu isagay ku ducaysan
doonaan, oo isagay ku faani doonaan. 3 Rabbigu wuxuu
dadka dalka Yahuudah iyo reer Yeruusaalem ku leeyahay,
Dhulkiinna jeexan jabsada, oo qodxan dhexdood waxba
ha ku beeranina. 4 Raggiinna dalka Yahuudah iyo kuwa
Yeruusaalem degganow, Rabbiga isu guda, oo iska gooya
buuryada qalbigiinna, si ayan cadhadaydu u soo bixin sida
dab oo kale, oo ayan u hurin si aan innaba loo demin

karin sharka falimihiinna aawadiis. 5 Dalka Yahuudah ka
dhex sheega, oo Yeruusaalem ka dhex naadiya, oo waxaad
tidhaahdaan, War dalka dhexdiisa buunka ku dhufta, oo
aad u qayliya, oo waxaad tidhaahdaan, Isa soo urursada,
oo ina keena aynu magaalooyinka deyrka leh galnee. 6
Calan u taaga xagga Siyoon, carara oo ha joogsanina,
waayo, anigu waxaan xagga woqooyi ka keeni doonaa
masiibo iyo halligaad weyn. 7 Libaax baa ka soo baxay
jiqdiisa, quruumo baabbi'iyihiina wuu soo kacay, oo wuxuu
meeshiisii uga soo baxay inuu dalkaaga cidlo ka dhigo, oo
magaalooyinkaagana waa la baabbi'in doonaa, oo qofna
ma degganaan doono. 8 Taas aawadeed dhar joonyad ah
guntada, oo baroorta, oo qayliya, waayo, cadhadii Rabbiga
oo kululayd nagama noqon. 9 Oo Rabbigu wuxuu leeyahay,
Waxaa maalintaas noqon doona in boqorka qalbigiisa iyo
amiirrada qalbigooduba ay kharribmaan, oo wadaaddaduna
way yaabi doonaan, oo nebiyaduna way fajici doonaan. 10
Markaasaan idhi, Sayidow, Rabbiyow, sida xaqiiqada ah
dadkan iyo Yeruusaalemba aad iyo aad baad u khiyaanaysay,
waayo, iyagoo seefi naftooda soo gaadhaysa ayaad ku
tidhaahdaa, Nabad baad helaysaan. 11 Oo wakhtigaas
waxaa dadkan iyo Yeruusaalemba lagu odhan doonaa,
Dadkayga dabayl kulul ayaa uga iman doonta xagga meelaha
dhaadheer ee cidlada ku yaal, mana ahaan doonto mid
wax haadinaysa amase wax safaynaysa, 12 laakiinse
waxay ahaan doontaa dabayl xoog badan oo amarkayga ku
imanaysa, oo weliba haatan anigu xukunkoodii waan ku
hadli doonaa. 13 Bal eega, isagu wuxuu u iman doonaa sida
daruur oo kale, oo gaadhifardoodyadiisuna waxay ahaan
doonaan sida dabayl cirwareen ah oo kale, oo fardihiisuna
xataa gorgorrada way ka sii dheereeyaan. Annagaa hoognay!
Waayo, waannu baabba'nay. 14 Yeruusaalemay, qalbigaaga
xumaanta ka maydh, si aad u badbaaddo aawadeed. Ilaa
goormay fikirradaada sharka ahu kugu sii dhex jirayaan?
15 Waayo, xagga Daan cod baa ka yeedhaya, oo buuraha
Efrayimna belaayo baa laga naadiyaa. 16 Quruumaha u diga
oo Yeruusaalem ogeysiiya in ilaallo ay dal fog ka imanayaan,
oo ay magaalooyinkii dalka Yahuudah ku qaylinayaan.
17 Rabbigu wuxuu leeyahay, Sida kuwa beer dhawraya
ayay hareeraheeda kaga kacsan yihiin, maxaa yeelay,
iyadu way igu caasiyowday. 18 Jidkaaga iyo falimahaaga
ayaa waxyaalahan kuu keenay, tanu waa belaayadaada,
wayna qadhaadh tahay, oo waxay gaadhaysaa xataa ilaa
qalbigaaga. 19 Calooshaydiiyey, calooshaydiiyey! Aniga
qalbigaa i xanuunaya, oo wadnahaa i fig leh. Iskamana
aamusi karo, maxaa yeelay, naftaydiiyey, waxaad maqashay
buunka dhawaaqiisii iyo qayladii dagaalka. 20 Belaayo
baa belaayay ku soo kor dhacday, ayaa lagu dhawaaqay,
waayo, dalkii oo dhan waa baabba'ay. Teendhooyinkaygii
haddiiba way baabbe'een, oo daahyadaydiina daqiiqad
qudha ayay dhammaadeen. 21 Ilaa goormaan calanka
arkayaa, oo aan buunka dhawaaqiisa sii maqlayaa? 22
Waayo, dadkaygu waa nacasyo, oo aniga ima ay yaqaaniin.
Iyagu waa carruur caqlidaran, oo innaba waxgarasho ma
leh. Inay xumaan sameeyaan way u caqli badan yihiin,
laakiinse inay samaan sameeyaan innaba aqoon uma leh. 23
Bal eega, dhulkaan fiiriyey, oo waxaan arkay inuusan qaab
lahayn oo uu madhan yahay, oo haddana samooyinkaan
fiiriyey, oo iyana innaba iftiin ma ay lahayn. 24 Buurahaan
fiiriyey, oo waxaan arkay inay gariirayeen, oo kurihii oo
dhammuna way wada dhaqdhaqaaqayeen. 25 Oo haddana
wax baan fiiriyey, oo ninna ma jirin, oo haaddii hawada
oo dhammuna way wada carareen. 26 Oo haddana wax
baan fiiriyey, oo waxaan arkay dhulkii midhaha badnaa oo
abaaroobay, oo magaalooyinkeedii oo dhammuna Rabbiga
hortiisa ayay ku dundunsanaayeen cadhadiisii kululayd
daraaddeed. 27 Waayo, Rabbigu wuxuu leeyahay, Dalka
oo dhammu wuu cidloobi doonaa, laakiinse anigu kulligiis
wada baabbi'in maayo. 28 Taas aawadeed dhulku wuu u
barooran doonaa, oo samooyinka sarena way u madoobaan
doonaan, maxaa yeelay, waxan anigaa ku hadlay, oo anigaa
u qasdiyey, oo innaba ka qoomamoon maayo, kana soo
noqon maayo marnaba. 29 Magaalada oo dhammu waxay
ka qixi doontaa qaylada fardoleyda iyo qaansoleyda, oo
jiqday ku carari doonaan, dhagaxyada dushoodana way
fuuli doonaan, magaalo kastana waa laga tegi doonaa, oo
nin qudhuhuna ma degganaan doono. 30 Oo markii lagu
dhoco bal maxaad samayn doontaa? In kastoo aad dhar
guduudan xidhatid, iyo in kastoo aad dahab isku sharraxdid,
iyo in kastoo aad indhakuul iska badisidba, waxtarla'aan
baad isu qurxinaysaa, waayo, kuwii ku caashaqi jiray way
ku wada quudhsadaan, oo waxay doonayaan inay nafta
kaa qaadaan. 31 Waayo, waxaan maqlay cod sidii naag
foolanaysa, iyo qaylo sidii mid ilmaheedii ugu horreeyey
dhalaysa, waana codkii magaalada Siyoon, oo taahaysa,
oo gacmaheeda kala fidisa, oo waxay tidhaahdaa, anigaa
haatan hoogay! Waayo, naftaydii aad bay ugu daallan tahay
gacankudhiiglayaasha aawadood.

5 Bal jidadka Yeruusaalem hore iyo dib ugu orda, oo bal
fiiriya, oo garta, oo meelaheeda balballaadhanna ka
doondoona nin qudha oo caddaalad sameeya oo runta
doondoona, oo haddaad ka heli kartaanna iyada waan cafiyi
doonaa. 2 Oo weliba in kastoo ay yidhaahdaan, Waa iga

Rabbiga nool, sida xaqiiqada ah been bay ku dhaartaan. 3
Rabbiyow, indhahaagu runta sow ma fiiriyaan? Iyaga wax
baad ku dhufatay, laakiinse innaba kama ay xumaan, oo
waad baabbi'isay, laakiinse way diideen inay edeb qaataan.
Wejigoodiina waxay ka dhigeen wax dhagax ka sii adag,
oo inay soo noqdaanna way diideen. 4 Markaasaan idhi,
Sida xaqiiqada ah kuwanu waa masaakiin, oo waa nacasyo,
waayo, Rabbiga jidkiisa iyo qaynuunka Ilaahooda toona garan
maayaan. 5 Waxaan u tegi doonaa ragga waaweyn, oo waan
la hadli doonaa, waayo, iyagu Rabbiga jidkiisa iyo qaynuunka
Ilaahooda way yaqaaniin. Laakiinse kuwanu dhammaantood
harqoodkii way jebiyeen, oo xadhkihiina way kala gooyeen.
6 Oo sidaas daraaddeed waxaa iyaga dili doona libaax
kaynta ka soo baxay, oo waxaa baabbi'in doonta yeyda
fiideed. Oo magaalooyinkoodana waxaa gaagaatami doona
shabeel, oo ku alla kii halkaas ka soo baxaba waa la kala
dildillaacsan doonaa, maxaa yeelay, xadgudubyadoodu waa
tiro badan yihiin, oo dibunoqoshadoodiina waa sii korodhay.
7 Sidee baan kuu saamixi karaa? Carruurtaadii way iga
tageen, oo waxay ku dhaarteen kuwa aan ilaahyo ahayn,
oo markaan dherdhergiyey dabadeed ayay sinaysteen,
oo iyagoo guutooyin ah ayay guryihii dhillooyinka ku soo
urureen. 8 Waxay la mid noqdeen sidii fardo aroortii la
barqiyey, oo midkood kastaaba wuxuu ka daba dananay
naagtii deriskiisa. 9 Rabbigu wuxuu leeyahay, Miyaanan iyaga
waxyaalahan u ciqaabayn? Miyaanse naftaydu ka aarsanayn
quruuntii tan oo kale ah? 10 Derbiyadeeda fuula oo dumiya,
laakiinse ha wada baabbi'inina. Laamaheedana qaada,
waayo, kuwii Rabbiga ma aha. 11 Waayo, dadka Israa'iil iyo
dadka Yahuudahba khiyaano bay igula macaamiloodeen,
ayaa Rabbigu leeyahay. 12 Rabbiga way dafireen, oo waxay
yidhaahdeen, Isagu ma jiro. Masiibo nagu dhici mayso,
oo seef iyo abaar midna arki mayno. 13 Oo nebiyaduna
dabayl bay noqon doonaan, oo eraygu iyaga kuma jiro,
oo sidaasaa iyaga lagu samayn doonaa. 14 Oo sidaas
daraaddeed Rabbiga ah Ilaaha ciidammadu wuxuu leeyahay,
Erayadan aad ku hadasheen aawadood bal ogaada, ereyga
afkaaga ku jira dab baan ka dhigi doonaa, oo dadkanna
waxaan ka dhigi doonaa xaabo, oo isna wuu wada baabbi'in
doonaa dhammaantood. 15 Rabbigu wuxuu leeyahay, Dadka
Israa'iilow, bal ogaada, quruun baan meel fog idinkaga
keeni doonaa, oo taasu waa quruun xoog badan, oo waa
quruun tan iyo waa hore jirtay, oo waa quruun aydaan
afkeeda aqoon, oo aydaan innaba garanayn wax alla
waxay yidhaahdaanba. 16 Gabooyahoodu waa sida qabri af
bannaan, oo kulligoodna waa wada rag xoog leh. 17 Oo iyagu
waxay dhammayn doonaan waxaad beeraha ka goosataan
iyo kibistiinna, oo waxay dhammayn doonaan wiilashiinna
iyo gabdhihiinna, oo waxay dhammayn doonaan adhyihiinna
iyo lo'diinnaba, oo waxay dhammayn doonaan canabkiinna
iyo berdihiinnaba, oo magaalooyinkiinna deyrka leh oo aad
isku hallaynaysaanna seef bay la dhici doonaan. 18 Oo
Rabbigu wuxuu leeyahay, Habase ahaatee, anigu wakhtigaas
idin wada baabbi'in maayo. 19 Oo markay yidhaahdaan,
Rabbiga Ilaahayaga ahu bal muxuu waxyaalahan oo dhan
noogu sameeyey? Kolkaas waxaad ku tidhaahdaa, Sidaad
Rabbiga uga tagteen, oo aad ilaahyo qalaad dalkiinna ugu
dhex adeegteen, sidaas oo kalaad shisheeyayaal ugu dhex
adeegi doontaan dal aan kiinna ahayn. 20 Waxan dadka
Yacquub ka dhex sheega, oo dadka Yahuudah ka dhex
naadiya, oo waxaad tidhaahdaan, 21 Dadka nacasyada
ahu oo aan waxgarashada lahayn, oo indhaha leh laakiinse
aan waxba arkin, oo dhegaha leh laakiinse aan waxba
maqlinow, bal haatan waxan maqla: 22 Rabbigu wuxuu
leeyahay, War miyeydaan iga cabsanayn? Oo miyeydaan
hortayda ku gariirayn? Waayo, anigu waxaan ahay kii
cammuudda badda uga dhigay soohdinta, oo amar weligiis
ah bixiyey inayan soo dhaafin, oo in kastoo ay mawjadaheedu
aad u dhacaan, innaba kama ay adkaan karaan, oo in
kastoo ay guuxaanna marna sooma ay dhaafi karaan. 23
Laakiinse dadkanu waxay leeyihiin qalbi fallaagoobaya oo
caasiyoobay, way fallaagoobeen oo way iska tageen. 24
Oo innaba qalbigooda iskama ay yidhaahdaan, War haatan
aynu ka cabsanno Rabbiga Ilaaheenna ah oo roobka hore
iyo kan dambeba xilligiisa ina siiya, oo toddobaadyada
beergoosashada loo go'ay inoo haya. 25 Xumaatooyinkiinna
ayaa waxyaalahan idinka celiyey, oo dembiyadiinna ayaa
waxyaalo wanwanaagsan idinka diiday. 26 Waayo, dadkayga
dhexdiisa waxaa laga helaa niman shar ah. Waxay u
gabbadaan sida kuwa wax dabta, oo intay dabin u qoolaan
ayay dad qabsadaan. 27 Sida qafas shimbirro ka buuxaan
oo kale ayaa guryahooda khiyaano uga buuxdaa, oo sidaas
daraaddeed ayay u weynaadeen oo u taajiroobeen. 28
Aad bay u buurnaadeen oo cayileen, oo xataa falimaha
sharka ahna aad bay u badiyaan, ma garsooraan oo
agoontana uma ay muddacaan si ay u barwaaqoobaan, oo
masaakiintana xaqooda uma ay sameeyaan. 29 Haddaba
Rabbigu wuxuu leeyahay, Miyaanan iyaga waxyaalahan u
ciqaabayn? Miyaanse naftaydu ka aarsanayn quruuntii tan
oo kale ah? 30 Wax baas oo yaab miidhan ah ayaa dalka
lagu dhex sameeyey. 31 Nebiyadii waxay sii sheegaan wax
been ah, oo wadaaddadiina waxay wax ku xukumaan iyaga
taladooda, oo dadkaygiina saasay jecel yihiin, laakiinse bal
maxaad ugudambaysta samayn doontaan?

6 Reer Benyaamiinow, Yeruusaalem dhexdeeda ka carara,
oo buunka Teqooca ka yeedhiya, oo Beyd Hakeremna
calaamad kor uga qaada, waayo, waxaa xagga woqooyi ka
soo socda masiibo iyo halligaad weyn. 2 Magaalada Siyoon
oo u eg naag suurad wacan oo jilicsan ayaan baabbi'in
doonaa. 3 Waxaa iyada u iman doona adhijirro adhyahoodii
wata, oo teendhooyinkooda ayay hareeraheeda ka dhisan
doonaan, oo midkood kastaaba wuxuu iska daaqsan doonaa
meeshiisa. 4 Isu diyaariya inaad iyada dagaal ugu kacdaan,
sara joogsada, oo ina keena aan iyada hadhka weerarnee.
Annagaa iska hoognay, waayo, gabbalkii waa dhacay, oo
hooskii habeennimo ayaa sii dheeraaday. 5 Sara joogsada,
oo ina keena aynu iyada habeennimo weerarnee, oo aynu
daaraheeda waaweyn wada duminnee. 6 Waayo, Rabbiga
ciidammadu wuxuu yidhi, Dhirteeda jara, oo Yeruusaalem
tuulmo ku tuula, waayo, tanu waa magaalada la ciqaabayo,
oo waxaa ka buuxa dulmi miidhan. 7 Sidii ili biyaheeda u
soo burqiso oo kale ayay sharnimadeeda u soo burqisaa
had iyo goorba, dhexdeedana waxaa laga maqlaa dulmi iyo
kharribaad, oo had iyo goorna waxaa hortayda yaal cudur
iyo nabro. 8 Yeruusaalemay, si aan naftaydu kaaga tegin, oo
aanan kaaga dhigin cidlo iyo dal aan ciduna degganayn,
edeb qaado. 9 Rabbigii ciidammadu wuxuu leeyahay, Kuwa
dadka Israa'iil ee hadhay waxaa loo wada xaabxaabi doonaa
sida geedcanab oo kale, Sida mid canab guranaya oo kale
gacanta dambiisha ku soo celiya. 10 Inay i maqlaan bal
yaan la hadlaa oo aan u digaa? Bal eega, dhegahoodu
ma xalaalaysna, oo waxba ma ay maqli karaan. Bal eega,
erayga Rabbigu cay buu iyaga u noqday, oo innaba kuma ay
farxaan. 11 Sidaas daraaddeed waxaa iga buuxda cadhadii
Rabbiga, oo inaan isceliyo waan ku daalay. Haddaba
cadhadii ku deji carruurta jidka joogta iyo shirka barbaarrada
oo dhan, waayo, xataa nin iyo naagtiisaba waa la kaxayn
doonaa, oo odayga iyo kan cimriga dheerba waa la isla wada
kaxayn doonaa. 12 Oo guryahooda, iyo beerahooda, iyo
naagahoodaba kuwa kalaa la siin doonaa dhammaantoodba,
waayo, Rabbigu wuxuu leeyahay, Anigu waxaan gacantayda
ku fidin doonaa dadka dalka deggan. 13 Waayo, kooda
ugu yar ilaa kooda ugu weyn midkood kastaaba wuxuu u
go'ay damacxumaan, oo nebiga iyo xataa wadaadka inta ka
dhexle midkood kastaaba been buu ku macaamiloodaa. 14
Oo iyagu dhaawicii dadkayga ayay si fudud u bogsiiyeen,
oo iyadoo aan innaba nabadu jirin ayay yidhaahdaan, Waa
nabad! Waa nabad! 15 Markay karaahiyada sameeyeen
miyey xishoodeen? Maya, innaba ma ay xishoon, ceebna
ma garan, sidaas daraaddeed waxay la dhici doonaan kuwa
dhacaya. Oo Rabbigu wuxuu leeyahay, Wakhtigii aan iyaga
soo ciqaabo ayay hoos u dhici doonaan. 16 Rabbigu wuxuu
leeyahay, Jidadka dhex istaaga, oo bal wax fiiriya, oo bal
dhabbayaashii hore haybsada, oo waxaad tidhaahdaan,
Meeh jidkii wanaagsanaa? Oo markaas ku socdaa, oo
naftiinna nasashaad u heli doontaan. Laakiinse iyagu waxay
yidhaahdeen, Annagu ku socon mayno jidkaas. 17 Oo weliba
waxaan idiin dhigay waardiyayaal, oo waxaan idinku idhi,
Buunka dhawaaqiisa dhegaysta. Laakiinse iyagu waxay
yidhaahdeen, Annagu waxba dhegaysan mayno. 18 Sidaas
daraaddeed, quruumahow bal maqla, oo ururkow, bal ogow
waxa kuwan ku dhici doona. 19 Dhulkow, bal maqal, oo
bal ogow, dadkan masiibaan ku soo dejin doonaa taasoo
ah waxay fikirradoodii keeneen, waayo, erayadaydii ma
ayan dhegaysan, sharcigaygiina way diideen. 20 Fooxa
Shebaa ka yimid iyo qasabka macaan ee dal fog laga
keenay maxay ii taraan? Qurbaannadiinna la gubo aqbali
maayo, oo allabaryadiinnuna iga farxin maayaan. 21 Oo
sidaas daraaddeed Rabbigu wuxuu leeyahay, Bal eega,
waxaan dadkan hor dhigi doonaa wax lagu turunturoodo,
oo aabbayaasha iyo wiilashuba way ku wada turunturoon
doonaan, oo deriska iyo saaxiibkiisba way wada halligmi
doonaan. 22 Rabbigu wuxuu leeyahay, Bal ogaada, dadyow
baa dalka woqooyi ka iman doona, oo quruun weyn ayaa
dhulka darafyadiisa ka soo kici doonta. 23 Oo waxay sitaan
qaansooyin iyo warmo, oo waa calool adag yihiin, oo innaba
naxariis ma leh. Codkoodana waxaa la moodaa sida bad
guuxaysa oo kale, oo farday fuulaan. Siyoonay, mid kastaaba
wuxuu kuugu soo safan yahay sida nin dagaal diyaar u ah oo
kale. 24 Waxaannu maqalnay warkoodii, oo gacmahayagii
way taag gabeen, oo cidhiidhi iyo xanuun baa noo qabtay
sida naag foolanaysa oo kale. 25 Berrinka ha u bixina, oo
jidkana ha marina, waayo, seeftii cadowga iyo cabsi baa
dhan kasta idinka jirta. 26 Dadkaygow, joonyad xidho, oo
dambas ku galgalo, oo waxaad u baroorataa sida wiil madi
ah loogu baroorto, oo waxaad ku ooydaa baroor aad u
qadhaadh, waayo, waxbaabbi'iyihii dhaqsuu inoogu soo
degi doonaa. 27 Waxaan dadkayga dhexdiisa kuu dhigay
inaad ahaatid imtixaame, si aad jidkooda u ogaatid oo
aad u imtixaantid. 28 Iyagu waa caasiyiin fallaagoobay,
oo xan bay la ordaan oo iyagu waa naxaas iyo bir, oo
kulligoodna waa kuwa wax kharriba. 29 Buufinkii aad buu
wax u buufiyaa, oo laxaamaddiina dabkaa baabba'saday, oo
lacag shubihiina waxtarla'aan buu wax u sii dhalaalinayaa,
waayo, sharrowyadii weli ma soocna. 30 Waxaa iyaga loogu
yeedhi doonaa, Lacag la nacay, waayo, Rabbigu iyaguu
nacay.

7 Kanu waa eraygii Yeremyaah uga yimid xagga Rabbiga,
isagoo leh, 2 Guriga Rabbiga iriddiisa istaag, oo waxaad
halkaas ka naadisaa eraygan, oo waxaad tidhaahdaa,
Kuwiinna dadka Yahuudah oo irdahan u gala inaad Rabbiga
caabuddaanow, kulligiin bal erayga Rabbiga maqla. 3
Rabbiga ciidammada oo ah Ilaaha reer binu Israa'iil wuxuu
leeyahay, Jidadkiinna iyo falimihiinnaba hagaajiya, oo anna
waan idinka yeeli doonaa inaad meeshan degganaataan.
4 Ha isku hallaynina erayo been ah oo leh, Macbudkii
Rabbiga, Macbudkii Rabbiga, Macbudkii Rabbigu waa
kan. 5 Waayo, haddaad jidadkiinna iyo falimihiinnaba
wada hagaajisaan, oo aad caddaalad ugu garsoortaan nin
iyo deriskiisa, 6 iyo haddaydnan dulmin shisheeyaha iyo
agoonta iyo carmalka, oo aydaan meeshan ku daadin dhiig
aan xaq qabin, oo aydaan ilaahyo kale waxyeelladiinna
u daba gelin, 7 de markaas waxaan idinka yeeli doonaa
inaad degganaataan meeshan, oo ah dalkii aan waa hore
awowayaashiin u siiyey inay weligood lahaadaan. 8 Bal
eega, idinku waxaad isku hallaysaan erayo been ah oo
aan waxba idin tari karin. 9 Intaad wax xaddaan, oo
dhiig daadisaan, oo sinaysataan, oo been ku dhaarataan,
oo Bacal foox u shiddaan, oo ilaahyo kale oo aydaan
aqoon daba gashaan, 10 miyaad i hor imanaysaan, oo
gurigan laygu magacaabay gudihiisa soo istaagaysaan, oo
odhanaysaan, Annaga waa nala samatabbixiyey, si aad
haddana karaahiyadan oo dhan u sii samaysaan? 11 Gurigan
laygu magacaabay ma wuxuu hortiinna ku noqday god
tuugo? Bal eega, Rabbigu wuxuu leeyahay, Aniguba waan
arkay. 12 Laakiinse haatan bal taga meeshaydii Shiiloh ku
oolli jirtay, oo aan markii ugu horraysay magacayga dejiyey,
oo bal soo arka wixii aan ugu sameeyey xumaantii dadkayga
reer binu Israa'iil aawadeed. 13 Oo haatan Rabbigu wuxuu
leeyahay, Idinku waxaad samayseen shuqulladan oo dhan,
oo anna goor wanaagsan waan idinla hadlay, laakiinse ima
aydaan maqlin, waanan idiin dhawaaqay, laakiinse iima
aydaan jawaabin, 14 sidaas daraaddeed gurigan laygu
magacaabay, oo aad isku hallaynaysaan, iyo meeshii aan
siiyey idinka iyo awowayaashiinba ayaan ku samayn doonaa
wixii aan Shiiloh ku sameeyey oo kale. 15 Oo idinkana
hortaydaan idinka xoori doonaa sidaan u xooray dhammaan
walaalihiinna ah farcankii Efrayim oo dhan. 16 Sidaas
daraaddeed dadkan ha u ducayn, oo baryootan iyo salaad
midna iyaga aawadood ha u samayn, oo hana ii baryin iyaga
aawadood, waayo, innaba ku maqli maayo. 17 War miyaadan
arkayn waxay ku dhex sameeyaan magaalooyinka dalka
Yahuudah iyo jidadka Yeruusaalemba? 18 Carruurtu qoryay
soo guraan, aabbayaashuna dabkay shidaan, naaguhuna bur
bay cajiimaan inay kibis u sameeyaan boqoradda samada,
oo ay ilaahyo kale qurbaanno cabniin ah u daadiyaan, si
ay iga cadhaysiiyaan. 19 Rabbigu wuxuu leeyahay, Ma
aniga baa kan ay ka cadhaysiiyaan? Sow iyagu iskagama
ay cadhaysiin ceebta ay isku soo jiideen? 20 Sidaas
daraaddeed Sayidka Rabbiga ahu wuxuu leeyahay, Bal
ogaada, xanaaqayga iyo cadhadayda ayaan ku soo dejin
doonaa meeshan iyo dadka iyo duunyada, iyo dhirta duurka,
iyo midhaha dhulkaba. Cadhadaydu way wada gubi doontaa
oo lamana demin doono. 21 Rabbiga ciidammada oo Ilaaha
reer binu Israa'iil ahu wuxuu leeyahay, Qurbaannadiinna la
gubo allabaryadiinna ku darsada, oo hilibkana iska cuna.
22 Waayo, waagii aan awowayaashiin dalka Masar ka soo
bixiyey kalama hadlin, kumana amrin wax ku saabsan
qurbaanno la gubo iyo allabaryo toona, 23 laakiinse waxaan
iyaga ku amray, oo aan ku idhi, Codkayga dhegaysta, oo
anigu waxaan idiin noqon doonaa Ilaah, idinkuna waxaad
ahaan doontaan dadkayga oo ku socda jidkii aan idinku
amray oo dhan, si aad u nabdoonaataan. 24 Laakiinse
ima ay dhegaysan, dhegna iima dhigin, illowse waxay ku
socdeen talooyinkii iyo caasinimadii qalbigooda sharka ah,
oo dib bay u socdeen, horena uma dhaqaaqin. 25 Tan iyo
maalintii ay awowayaashiin dalkii Masar ka soo bexeen
iyo ilaa maantadan la joogo waxaan maalin kasta idiin soo
diri jiray midiidinnadayda nebiyadii addoommadaydii ahaa
oo dhan, anigoo goor wanaagsan diraya. 26 Laakiinse
ima ay dhegaysan, dhegna iima ay dhigin, illowse way
sii madax adkaadeen, oo waxay sameeyeen wax ka sii
xun wixii ay awowayaashood samayn jireen. 27 Haddaba
waa inaad erayadan oo dhan u sheegtaa, laakiinse iyagu
kuma ay dhegaysan doonaan, oo weliba waa inaad u
dhawaaqdaa, laakiinse innaba kuuma ay jawaabi doonaan.
28 Oo waxaad ku tidhaahdaa, Tanu waa quruun aan codka
Rabbiga Ilaahooda dhegaysan, oo aan innaba edeb qaadan.
Runtii way baabba'day, oo afkooday ka go'day. 29 Timahaaga
iska xiir oo iska xoor, oo waxaad ku baroorataa meelaha
dhaadheer, waayo, Rabbigu waa nacay oo waa ka tegey
qarniga cadhadiisu ku dhacday. 30 Waayo, Rabbigu wuxuu
leeyahay, Dadka Yahuudah wax hortayda shar ku ah ayay
sameeyeen. Si ay gurigii laygu magacaabay u nijaaseeyaan
ayay karaahiyadoodii dhex qotomiyeen. 31 Oo waxay
dhisteen meelaha sarsare ee Tofed oo ku dhex yaal dooxada
ina Xinnom, si ay wiilashooda iyo gabdhahoodaba dab ugu
dhex gubaan, taasoo aanan iyaga ku amrin, oo aan innaba
qalbigayga soo gelin. 32 Sidaas daraaddeed Rabbigu wuxuu
leeyahay, Waxaa iman doona wakhti aan mar dambe loogu
yeedhi doonin Tofed, amase dooxadii ina Xinnom, laakiinse

waxaa lagu magacaabi doonaa Dooxadii Gowracidda, waayo,
waxay meydad ku aasi doonaan Tofed, maxaa yeelay, meel
kalaa la waayi doonaa. 33 Waayo, dadkan meydkoodu
wuxuu cunto u noqon doonaa haadka samada iyo dugaagga
dhulka, oo ciduna kama ay eryi doonto. 34 Oo markaasaan
magaalooyinka dalka Yahuudah iyo jidadka Yeruusaalemba
ka joojin doonaa codka rayraynta, iyo codka farxadda, iyo
codka arooska, iyo codka aroosaddaba, waayo, dalku wuxuu
noqon doonaa cidla.

**8** Rabbigu wuxuu leeyahay, Wakhtigaas waxaa
qabriyadoodii laga soo bixin doonaa lafihii boqorrada dalka
Yahuudah, iyo lafihii amiirradiisa, iyo lafihii wadaaddada, iyo
lafihii nebiyada, iyo lafihii dadkii Yeruusaalem degganaaba. 2
Oo waxaa lagu kala bixin doonaa dhulka hoos yaal qorraxda,
iyo dayaxa, iyo ciidanka samada oo dhan, kuwaasoo ay
jeclaan jireen, oo ay u adeegi jireen, oo ay daba socon
jireen, oo ay doondooni jireen, oo ay caabudi jireen. Lama
soo ururin doono, lamana aasi doono, oo sida digo oo
kale ayay dhulka saarnaan doonaan. 3 Oo Rabbigu wuxuu
leeyahay, Kuwa qoladan sharka ah ka hadhi doona oo
dhammu waxay nolosha ka dooran doonaan dhimasho,
waana kuwa ku hadhi doona meelaha aan u kexeeyey
oo dhan. 4 Weliba waxaad iyaga ku tidhaahdaa, Rabbigu
wuxuu leeyahay, Kuwa dhacaa miyeyan soo kicin? Kii
leexdaase miyuusan soo noqon? 5 Haddaba dadkan
reer Yeruusaalem bal maxay dib ugugu simbiriirixdeen
dibunoqosho weligeed ah? Iyagu khiyaano way xajisanayaan,
wayna diidaan inay soo noqdaan. 6 Waan dhegaystay
oo waan maqlay, laakiinse si qumman uma ay hadlin. Oo
midkoodna xumaantiisii kama toobadkeeno, isagoo leh,
Bal maxaan sameeyey? Mid kastaaba wuxuu u leexdaa
jidkiisii sida faras dagaal ku yaacaya. 7 Sida xaqiiqada ah
xuurta samadu xilligeeda way taqaan, oo qoolleyda, iyo
dabfallaadha, iyo saratoosiyuhuba way dhawraan xilliga
imaatinkooda, laakiinse dadkaygu Rabbiga xukunkiisa ma ay
yaqaaniin. 8 Haddaba bal sidee baad u tidhaahdaan, Annagu
xigmad baannu leennahay, oo Rabbiga sharcigiisuna waa
nala jiraa? Laakiinse qalinkii beenta ahaa ee karraaniyada
ayaa been ka dhigay. 9 Nimankii xigmadda lahaa way
ceeboobeen, wayna argaggexeen oo waa la kaxaystay, bal
eega, Eraygii Rabbiga way diideen, haddaba xigmadda ku
jirta waa maxay? 10 Sidaas daraaddeed waxaan naagahooda
siin doonaa kuwa kale, oo beerahoodana waxaan siin
doonaa kuwo xantiyi doona, waayo, midkood kasta kan ugu
yar ilaa kan ugu weynuba wuxuu u go'ay damacxumaan, oo
nebiga iyo xataa wadaadka inta ka dhexle midkood kastaaba
been buu ku macaamiloodaa. 11 Waayo, iyagu dhaawicii
dadkayga ayay si fudud u bogsiiyeen, oo iyadoo aan innaba
nabadu jirin ayay yidhaahdaan, Waa nabad! Waa nabad!
12 Markay karaahiyada sameeyeen miyey xishoodeen?
Maya, innaba ma ay xishoon, ceebna ma garan, sidaas
daraaddeed waxay la dhici doonaan kuwa dhacaya. Oo
Rabbigu wuxuu leeyahay, Wakhtiga ciqaabtooda ayay hoos
u dhici doonaan. 13 Rabbigu wuxuu leeyahay, Waan wada
baabbi'in doonaa. Geedcanabka midho kuma oolli doonaan,
oo geedberdahana midho kuma oolli doonaan, oo caleentuna
way wada dhadi doontaa, oo waxyaalihii aan siiyey oo
dhammu way ka wada dhammaan doonaan. 14 Bal maxaynu
isaga fadhinnaa? Isa soo wada urursada, oo ina keena
aynu magaalooyinka deyrka leh galnee, oo aynu halkaas
ku halliganno, waayo, Rabbiga Ilaaheenna ah ayaa ina
halligay, oo wuxuu ina cabsiiyey biyo xammeetiyeed, maxaa
yeelay, Rabbigeenna waynu ku dembaabnay. 15 Innagu
nabad baynu sugaynay, laakiinse wanaag inooma iman,
oo waxaynu sugaynay wakhti caafimaad leh, oo bal eega
naxdin baa inoo timid! 16 Bururuftii fardihiisa dalka Daan
baa laga maqlay, oo dalkii oo dhammuna wuxuu la gariiray
dananiddii kuwiisa xoogga badan, waayo, way yimaadeen,
oo waxay wada baabbi'iyeen dalkii, iyo wixii ku dhex jiray oo
dhan, iyo magaalooyinkii iyo kuwii degganaa oo dhanba. 17
Waayo, Rabbigu wuxuu leeyahay, Bal ogaada, Anigu waxaan
dhexdiinna ku soo dayn doonaa abeesooyin iyo jilbisyo
aan la sixri karin, oo iyana way idin qaniini doonaan. 18
Murugtaydu waa mid aan la fududayn karin, oo qalbigaygiina
waa igu dhex taag darnaaday. 19 Bal maqla codka qaylada
dadkayga oo dal fog ka yeedhaya. Sow Rabbigu Siyoon ma
joogo? Sow boqorkeedii ma dhex joogo? Bal maxay iigaga
cadhaysiiyeen sanamyadooda xardhan iyo waxyaalahooda
qalaad ee aan waxtarka lahayn? 20 Beergoosadkii waa
dhaafay, oo midhoguriddiina waa idlaatay, laakiin innagu
weli ma aynu badbaadin. 21 Anigu waxaan ku xanuunsaday
nabarkii ku dhacay dadkayga. Murug baan la madoobaaday,
oo yaab baa i haya. 22 Ma Gilecaad baan beeyo dawo
ah oollin, mase dhakhtar baan halkaas joogin? Bal maxaa
bogsiinta dadkaygu u dhammaystirmi weyday?

**9** Bal muu madaxaygu biyo noqdo, oo bal may indhahayguna
il biyood oo ilmo daadisa noqdaan, si aan habeen iyo
maalinba ugu ooyo kuwa laga laayay dadkayga! 2 Bal maan
cidlada ku lahaado hoy ay socotooyinku ku dhaxaan, si aan
dadkayga uga tago, oo aan iyaga uga fogaado! Waayo, iyagu
dhammaantood waxay noqdeen dhillayo, iyo urur khaa'inno
ah. 3 Carrabkooda ayay been ugu xoodaan sida qaanso oo
kale, oo dhulkay ku xoogaysteen, runtase uma aha, waayo,

sharba shar bay uga sii gudbaan, oo ima ay yaqaaniin, ayaa
Rabbigu leeyahay. **4** Midkiin kastaaba deriskiisa ha iska jiro
oo walaalna ha isku hallaynina, waayo, walaal kastaaba waa
khaa'in, oo deris kastaaba xan buu la wareegaa. **5** Midkood
kastaaba wuxuu khiyaaneeyaa deriskiisa, oo runtana kuma
ay hadlaan. Waxay carrabkooda bareen inuu been ku hadlo,
oo waxay isku daaliyaan inay xumaan sameeyaan. **6** Rabbigu
wuxuu leeyahay, Rugtaadu waxay ku dhex jirtaa khiyaano,
oo khiyaano aawadeed ayay u diidaan inay i aqoonsadaan.
**7** Sidaas daraaddeed Rabbiga ciidammadu wuxuu leeyahay,
Bal ogaada, iyagaan dhalaalin doonaa, waanan tijaabin
doonaa, waayo, bal maxaa kaloo aan sameeyaa, dadkayga
dartiis? **8** Carrabkoodu waa sida fallaadh wax dilaysa oo
kale. Khiyaanuu ku hadlaa. Mid waluba deriskiisa nabad buu
afka uga sheegaa, laakiinse uurka wuu uga gabbadaa. **9**
Rabbigu wuxuu leeyahay, Miyaanan iyaga waxyaalahan u
ciqaabayn? Miyaanse naftaydu ka aarsanayn quruun tanoo
kale ah? **10** Waxaan oohin iyo baroor kor ugu qaadi doonaa
buuraha aawadood, oo daaqsimaha cidladana waan u
barooran doonaa, maxaa yeelay, way gubteen si aan ciduna
u dhex marin. Oo ninna codkii lo'da kama maqli karo, haaddii
samada iyo dugaaggiiba way carareen oo way tageen. **11** Oo
waxaan Yeruusaalem ka dhigi doonaa tuulmooyin burbur ah,
iyo meel ay dawacooyinku ku hoydaan. Oo magaalooyinka
dalka Yahuudahna waxaan ka dhigi doonaa cidla aan
ciduna degganayn. **12** Waa kuma ninka xigmadda leh oo
waxan garan karaa? Oo kan Rabbiga afkiisu la hadlay inuu
waxyaalahan sheegi karaa waa kuma? Bal maxaa dalku u
halligmay, oo uu sidii cidlo oo kale ugu gubtay, si aan ciduna u
dhex marin? **13** Rabbigu wuxuu leeyahay, Iyagu sharcigaygii
aan hortooda dhigay way ka tageen, oo codkaygiina ma ay
addeecin, kumana ay dhex socon, **14** laakiinse waxay iska
daba galeen caasinimadii qalbigooda, iyo Bacaliim oo ay
awowayaashood iyaga bareen, **15** oo sidaas daraaddeed
Rabbiga ciidammada oo ah Ilaaha reer binu Israa'iil wuxuu
leeyahay, Dadkan waxaan ku quudin doonaa dacar, oo
waxaan cabsiin doonaa biyo xammeetiyeed. **16** Oo iyaga
waxaan ku kala dhex firdhin doonaa quruumaha iyaga iyo
awowayaashood toona ayan aqoonin, oo waxaan iyaga
ka daba diri doonaa seef jeeraan baabbi'iyo. **17** Rabbiga
ciidammadu wuxuu leeyahay, Aad u fiirsada, oo u yeedha
naagaha baroorta ha yimaadeene, waxaad u cid dirtaan
naagaha aad baroorta u yaqaan ha yimaadeene. **18** Oo
iyagu ha soo dhaqsadeen, oo aad ha noogu baroorteen, si
ay indhahayaga ilmo uga soo daadato oo ay biyona uga
soo butaacaan. **19** Waayo, waxaa Siyoon ka yeedhaya cod
baroor ah oo leh, Sidee baannu u baabba'nay! Aad iyo
aad baannu u ceebownay, maxaa yeelay, dalkii waannu
ka tagnay, oo hoyaashayadiina waa nalaga dumiyey. **20**
Dumarow, bal erayga Rabbiga maqla, oo dhegihiinnuna
erayga afkiisa ha aqbaleen, oo gabdhihiinnana baroorashada
bara, oo middiin kastaaba teeda kale ha barto. **21** Waayo,
geeri baa daaqadahayaga nooga soo dustay, oo waxay soo
gashay daarahayaga inay carruurta dibadda ka baabbi'iso,
oo ay barbaarradana jidadka ka baabbi'iso. **22** Waxaad
tidhaahdaa, Rabbigu wuxuu leeyahay, Dadka meydkiisu
wuxuu u soo daadan doonaa sida digo berrin bannaan taal
oo kale iyo sida gacan muggeed oo ka hadhay nin beer
soo goostay, oo ciduna sooma ururin doonto. **23** Rabbigu
wuxuu leeyahay, Kii xigmad lahu yuusan xigmaddiisa ku
faanin, oo kii xoog badanuna yuusan xooggiisa ku faanin,
oo kii taajir ahuna yuusan maalkiisa ku faanin, **24** laakiinse
kii faanaa ha ku faano inuu i garanayo oo uu i yaqaan
inaan anigu ahay Rabbiga dhulka ku sameeya raxmadda,
iyo caddaaladda, iyo xaqnimada, waayo, Rabbigu wuxuu
leeyahay, Waxyaalahaasaan ku farxaa. **25** Rabbigu wuxuu
leeyahay, Bal ogaada, waxaa iman doona wakhtigii aan
ciqaabi doono kuwa gudan oo uurka ka buuryaqabka ah oo
dhan, **26** kuwaasoo ah reer Masar, iyo dadka Yahuudah, iyo
reer Edom, iyo reer Cammoon, iyo reer Moo'aab, iyo kuwa
timaha madaxa dhinac ka jara oo cidlada jooga oo dhan,
waayo, quruumahaas oo dhammu waa wada buuryaqab, oo
dadka Israa'iil oo dhammu xagga qalbigay buuryaqab ka
yihiin.

**10** Dadka Israa'iilow, bal maqla erayga Rabbigu idinkula
hadlayo. **2** Rabbigu wuxuu leeyahay, Ha baranina
jidka quruumaha, oo hana ka nixina calaamadaha samada,
waayo, quruumahaa ka naxa iyaga. **3** Waayo, dadyowga
caadooyinkoodu waxtar ma leh, maxaa yeelay, mid baa
kaynta geed ka soo jara, waana wax ay nin saanac ah
gacmihiisu faas ku sameeyaan. **4** Waxaa lagu sharraxaa
lacag iyo dahab, oo waxaa lagu dhuujiyaa musmaarro iyo
dubbayaal, si uusan u dhaqdhaqaaqin. **5** Sanamyadaas
waa sida geed timireed oo toosan, laakiinse ma ay hadlaan,
oo waxay u baahan yihiin in la qaado, maxaa yeelay, ma
ay socon karaan. Iyaga ha ka baqina, waayo, wax xun
idinkuma samayn karaan, oo weliba innaba wax san ma
samayn karaan. **6** Rabbiyow, mid kula mid ahu ma jiro.
Adigu waad weyn tahay, oo magacaaguna waa xoog badan
yahay. **7** Boqorka quruumahow, kan aan kaa cabsanaynu
waa kuma? Waayo, way kugu habboon tahay, maxaa yeelay,
kuwa xigmadda leh ee quruumaha iyo boqortooyooyinkooda
oo dhanba mid kula mid ahu ma jiro. **8** Laakiinse iyagu

dhammaantood waa doqonno iyo nacasyo, cilmigoodu waa
wax aan waxtar lahayn, waayo, waa qori uun. 9 Lacag
la tumay baa Tarshiish laga keenaa, oo dahabna Uufaas,
waana nin saanac ah shuqulkiis, iyo wixii lacagshubuhu uu
gacmihiisa ku sameeyey, oo dharkooduna waa buluug iyo
guduud, oo dhammaantoodna waa nin saanac ah shuqulkiis.
10 Laakiinse Rabbigu waa Ilaaha runta ah. Isagu waa
Ilaaha nool iyo boqorka weligiis ah. Cadhadiisa ayaa dhulku
la gariiraa, oo quruumuhuna uma ay adkaysan karaan
dhirifkiisa. 11 Waxaad iyaga ku tidhaahdaan, Ilaahyadii aan
samooyinka iyo dhulka samayninu way ka wada baabbi'i
doonaan dhulka dushiisa iyo samooyinka hoostooda. 12 Isagu
dhulka xooggiisuu ku sameeyey, dunidana xigmaddiisuu ku
dhisay, oo samooyinkana waxgarashadiisuu ku kala bixiyey.
13 Markuu codkiisa ku hadlo biyo badan guuxooda baa
samooyinka laga maqlaa, oo isagaa ka dhiga in dhulka
darafyadiisa uumi ka soo kaco, roobkana wuxuu u sameeyaa
hillaac, oo dabayshana isagaa khasnadihiisa ka soo saara.
14 Nin kastaaba wuxuu noqday doqon aan aqoon lahayn, oo
dahabshube kastaaba wuxuu ku ceeboobay sanamkiisii la
xardhay, waayo, sanamkiisii la shubay waa been oo innaba
neef ma leh. 15 Iyagu waa wax aan waxtar lahayn iyo
shuqul lagu majaajilowdo, oo wakhtiga ciqaabiddoodana
way wada baabbi'i doonaan. 16 Kan Yacquub qaybta u ah
iyaga la mid ma aha, waayo, isagu waa kan wax kasta
abuuray, oo reer binu Israa'iilna waa qoladii dhaxalkiisa, oo
magiciisuna waa Rabbiga ciidammada. 17 Tan la weerarayay,
alaabtaada dalka ka soo ururso. 18 Waayo, Rabbigu wuxuu
leeyahay, Bal eeg, dadka dalka deggan haddeer baan
wadhfin doonaa, oo waan dhibi doonaa si ay u dareemaan.
19 Anigaa iska hoogay nabarkayga aawadiis! Dhaawacaygu
aad buu u xun yahay, laakiinse waxaan is-idhi, Sida runta
ah kanu waa xanuundaran, waase inaan u adkaystaa.
20 Taambuuggaygii waa baabba'ay, oo xadhkahaygii oo
dhanna waa la jaray. Carruurtaydii way iga tageen oo ma
ay joogaan, oo innaba lama arko cid teendhadayda mar
dambe dhisaysa oo daahyadayda kor u taagaysa toona. 21
Waayo, adhijirradii way wada doqonoobeen, oo Rabbigana
waxba ma ay weyddiin. Oo sidaas daraaddeed ma ay
liibaanin, oo adhyahooda oo dhammuna way kala firidhsan
yihiin. 22 Bal maqla qaylada warka iyo rabshadda weyn oo
xagga dalka woqooyi ka soo socota, oo markaas waxaa
magaalooyinka dalka Yahuudah laga dhigi doonaa baabba'
iyo meel ay dawacooyinku ku hoydaan. 23 Rabbiyow, waan
ogahay in binu-aadmiga jidkiisu uusan gacantiisa ku jirin,
ninkii socda innaba karti uma leh inuu tallaabooyinkiisa
toosiyo. 24 Rabbiyow, i edbi, si caddaalad ah mooyaane
xanaaqaaga ha igu edbin, si aadan iiga dhigin wax aan
waxba ahayn. 25 Cadhadaada ku soo deji quruumaha
aan ku aqoon iyo qolooyinka aan magacaaga kugu baryin,
waayo, reer Yacquub way cuneen, hubaal way cuneen oo
dhammeeyeen, oo rugtoodiina way baabbi'iyeen.

11 Kanu waa eraygii Yeremyaah xagga Rabbiga uga yimid,
isagoo leh, 2 Axdigan erayadiisa dhegayso, oo dadka
dalka Yahuudah iyo kuwa Yeruusaalem degganba la hadal.
3 Oo adigu waxaad ku tidhaahdaa, Rabbiga ah Ilaaha reer
binu Israa'iil wuxuu leeyahay, Inkaaru ha ku dhacdo ninkii
aan dhegaysan erayada axdigan 4 ee aan awowayaashiin
ku amray waagii aan iyaga ka soo bixiyey dalkii Masar iyo
foornadii birta, oo aan ku idhi, Codkayga addeeca, oo wixii
aan idinku amro oo dhan yeela, oo sidaasaad dadkaygii
ku noqon doontaan, oo aniguna Ilaahiin baan idiin ahaan
doonaa, 5 si aan u oofiyo dhaartii aan awowayaashiin
ugu dhaartay inaan siin doono dal caano iyo malab la
barwaaqaysan, sida ay maantadan tahay. Markaasaan
u jawaabay oo waxaan idhi, Aamiin, Rabbiyow. 6 Oo
Rabbigu wuxuu igu yidhi, Erayadan oo dhan ka dhex naadi
magaalooyinka dalka Yahuudah, iyo jidadka Yeruusaalemba,
oo waxaad tidhaahdaa, Axdigan erayadiisa dhegaysta oo
yeela. 7 Waayo, si aad ah ayaan awowayaashiin ugu digay
tan iyo waagii aan iyaga dalkii Masar ka soo bixiyey iyo
ilaa maantadan la joogo inta ka dhex leh, anigoo goor
wanaagsan u digaya oo ku leh, Codkayga addeeca. 8
Laakiinse ima ay addeecin oo dhegna iima ay dhigin,
laakiinse midkood kastaaba wuxuu daba galay caasinimada
qalbigiisa sharka ah. Sidaas daraaddeed waxaan iyaga ku
soo dejiyey axdigan erayadiisa oo dhan, kuwaasoo aan ku
amray inay sameeyaan, laakiinse ayan samaynin. 9 Oo
waxaa Rabbigu igu yidhi, Dadka dalka Yahuudah iyo kuwa
Yeruusaalem degganba waxaa laga dhex helay shirqool. 10
Waxay dib ugu noqdeen xumaatooyinkii awowayaashoodii
diiday inay erayadayda maqlaan, oo waxay daba galeen
ilaahyo kale inay iyaga u adeegaan aawadeed. Dadka dalka
Israa'iil iyo dadka Yahuudahba way jebiyeen axdigaygii
aan awowayaashood la dhigtay. 11 Oo sidaas daraaddeed
Rabbigu wuxuu leeyahay, Bal eega, waxaan iyaga ku soo
dayn doonaa masiibo ayan kari doonin inay ka baxsadaan,
oo in kastoo ay ii soo qayshadaanna, innaba dheg uma dhigi
doono. 12 Oo markaasaa magaalooyinka dalka Yahuudah iyo
kuwa Yeruusaalem degganuba waxay u tegi oo u qayshan
doonaan ilaahyadii ay fooxa u shidi jireen, laakiinse iyagu
innaba ma ay badbaadin doonaan wakhtiga ay dhibaataysan
yihiin. 13 Dadka Yahuudah ahow, ilaahyadiinnu waxay tiro

le'eg yihiin magaalooyinkiinna, oo jidadka Yeruusaalem intay
tiro le'eg yihiin oo kale ayaad meelo allabaryo u qotomiseen
waxaas ceebta miidhan ah, waana meelo allabaryo oo aad
foox ugu shiddaan Bacal. 14 Sidaas daraaddeed dadkan
ha u ducayn, oo iyaga aawadood kor ha ugu qaadin qaylo
iyo salaad toona, waayo, anigu dheg uma dhigi doono
wakhtigii ay ii soo qayshadaan dhibkooda aawadiis. 15
Taan jeclaa bal maxay gurigayga ku leedahay iyadoo kuwa
badan wasakhnimo la samaysay? Ma hilibka quduuska ahu
belaayada kaa qaadi kara? Markaad shar samaysid ayaad
rayraysaa. 16 Rabbigu wuxuu magacaaga u bixiyey Geed
saytuun oo cagaar ah, oo qurxoon, oo midho wanaagsan.
Cod buuq weyn ayuu dab kula daayay, oo laamihiisiina way
wada jajabeen. 17 Waayo, Rabbiga ciidammada oo adiga
ku beeray ayaa masiibo kaaga hadlay, waana xumaanta
dadka Israa'iil iyo dadka Yahuudah aawadeed, taasoo ay
qudhoodu isku sameeyeen markay igaga cadhaysiiyeen
fooxii ay Bacal u shideen. 18 Oo Rabbiguna taas wuu i
ogeysiiyey, waanan ogaaday. Markaasaad falimahooda i
tustay. 19 Laakiinse anigu waxaan la mid ahaa neef baraar
ah oo loo soo kexeeyo in la gowraco, oo mana aan ogayn
inay shirqool ii hindiseen, oo ay yidhaahdeen, Geedka iyo
midhihiisaba aynu wada baabbi'inno, oo aynu isaga ka
gooyno dalka kuwa nool, si aan magiciisa mar dambe loo
soo xusuusan. 20 Laakiinse Rabbiga ciidammadow, adigoo
si caddaalad ah wax u xukumow, oo kelyaha iyo qalbigaba
imtixaamow, haddaba bal aargoosashadaada iyaga ku kor
dhacaysa aan arkee, waayo, dacwadaydii adigaan kuu
soo bandhigay. 21 Sidaas daraaddeed Rabbigu wuxuu ka
leeyahay dadka Canaatood oo doondoonaya inay naftaada
kaa qaadaan, oo kugu yidhaahda, Yaadan gacantayada ku
dhimanine Rabbiga magiciisa waxba ha ku sii sheegin, 22
Rabbiga ciidammadu wuxuu leeyahay, Bal ogow, Iyagaan
ciqaabi doonaa. Barbaarradu seef bay ku dhiman doonaan,
oo wiilashooda iyo gabdhahooduba abaar bay ku dhiman
doonaan. 23 Oo innaba iyaga midna kama hadhi doono,
waayo, dadka Canaatood masiibaan ku soo dayn doonaa
sannadda ciqaabiddooda.

12 Rabbiyow, xaq baad tahay markaan kula muddaco,
haddaba bal aan xukummadaada kaala hadlo.
Sharrowyada jidkoodu bal muxuu u hagaagaa? Oo kuwa
khiyaano kula macaamiloodo oo dhammuna bal maxay u
nabdoon yihiin? 2 Iyagaad beertay, oo weliba xidid bay
yeesheen, way koraan, oo midhay dhalaan. Adigu afkooda
waad ku dhow dahay, laakiinse qalbigooda waad ka fog
tahay. 3 Laakiinse, Rabbiyow, adigu waad i taqaan, waanad
i aragtaa, oo qalbigaygana xaggaagaad u tijaabisaa. Iyaga
u soo bixi sida ido la gowracayo, oo u diyaari maalinta
gowracidda. 4 Ilaa goormuu dalku sii barooranayaa, oo uu
waddanka oo dhan dooggiisu engegayaa? Xumaanta kuwa
dhex deggan aawadeed ayaa xayawaankii iyo shimbirrihiiba
wada baabbe'een, maxaa yeelay, dadku waxay yidhaahdeen,
Isagu ugudambaystayada ma uu arki doono. 5 Haddaad rag
lug ah la orodday oo ay ku daaliyeen, haddaba bal sidee
baad fardo ula tartami kartaa? Oo haddii lagugu daaliyo
dalkii nabadda ahaa oo aad isku hallaynaysay, haddaba bal
maxaad ku dhex samayn doontaa kibirka Webi Urdun? 6
Waayo, xataa walaalaha iyo reerkii aabbahaaba khiyaano
bay kugula macaamiloodeen, oo weliba aad bay kaaga
soo daba qayliyeen. In kastoo ay erayo wanaagsan kugula
hadlaan, ha rumaysan. 7 Anigu gurigaygii waan ka tegey, oo
dhaxalkaygiina waan iska xooray, oo tii ay naftaydu aad u
jeclaydna waxaan gacanta u geliyey cadaawayaasheedii.
8 Tan dhaxalkaygii ahayd waxay igu noqotay sidii libaax
kaynta ku jira oo kale, codkeeday kor iigu qaadday, oo
sidaas daraaddeed waan nebcaaday. 9 Tan dhaxalkaygii
ahayd waxay igu tahay xaad birdhicyo leh oo kale, oo
xaadka hareereheeda ku wareegsan oo dhammuna waa ku
col iyada. Taga oo xayawaanka duurka oo dhan soo wada
ururiya, oo soo wada kaxeeya ha cuneene. 10 Adhijirro badan
ayaa beertaydii canabka ahayd baabbi'iyey, qaybtaydii cagta
bay kula tunteen, oo qaybtaydii wanaagsanaydna waxay ka
dhigeen lamadegaan cidla ah. 11 Cidla bay ka dhigeen, oo
iyadoo cidla ah ayay xaggayga u soo baroorataa. Dalkii oo
dhan cidla waa laga dhigay, waayo, ninna dan kama galo. 12
Meelaha dhaadheer oo cidlada ku dhex yaal oo dhan waxaa
ku soo kacay baabbi'iyayaashii, waayo, seefta Rabbiga
ayaa wax ka baabbi'isa dalka darafkiisan iyo ilaa darafka
kale inta ka dhex leh, oo binu-aadmiga oo dhan midnaba
nabad ma leh. 13 Iyagu waxay beerteen sarreen, laakiinse
qodxan bay soo goosteen, aad bay u daaleen, laakiinse
innaba ma ay faa'iidaan. Waxaad ku ceeboobi doontaan
midhaha aad goosanaysaan, waana Rabbiga cadhadiisa
kulul aawadeed. 14 Derisyadayda sharka ah oo dhan oo
taabta dhaxalkii aan dadkayga reer binu Israa'iil dhaxalsiiyey,
Rabbigu wuxuu ka leeyahay, Bal ogaada, iyagaan dalka ka
rujin doonaa, oo dadka Yahuudahna waan ka rujin doonaa
dhexdooda. 15 Oo markaan iyaga rujiyo dabadeed waan
soo noqon doonaa oo iyagaan u naxariisan doonaa, oo
mar kalaan ku soo celin doonaa nin kasta dhaxalkiisii iyo
dhulkiisii. 16 Oo hadday jidadka dadkayga aad u bartaan
oo ay magacayga ku dhaartaan iyagoo leh, Rabbiga nool
baannu ku dhaaranaynaa, xataa siday dadkayga u bareen

inay Bacal ku dhaartaan, markaas iyagaa lagu dhisi doonaa
dadkayga dhexdiisa. 17 Laakiinse Rabbigu wuxuu leeyahay,
Hadday i dhegaysan waayaan, quruuntaas waan wada rujin
doonaa, oo waan baabbi'in doonaa.

13 Rabbigu wuxuu igu yidhi, Tag oo waxaad soo iibsataa
gunti maro wanaagsan ah oo dhexda ku xidho, oo
marnaba biyo ha dhex gelin. 2 Sidaas daraaddeed gunti
baan soo iibsaday sidii erayga Rabbigu ahaa, oo dhexdaan
ku xidhay. 3 Oo haddana mar labaad ayaa eraygii Rabbigu
ii yimid, oo wuxuu igu yidhi, 4 Waxaad qaadataa guntigii
aad soo iibsatay oo haatan dhexda kuugu xidhan, oo kac,
oo waxaad tagtaa xagga Webi Yufraad, oo halkaas ku qari
dhagaxa weyn godkiisa. 5 Sidaas daraaddeed waan tegey
oo waxaan guntigii ku soo qariyey Webi Yufraad agtiisa,
sidii Rabbigu igu amray. 6 Oo maalmo badan dabadeed
ayaa Rabbigu igu yidhi, Kac oo waxaad tagtaa xagga
Webi Yufraad, oo waxaad halkaas ka soo bixisaa guntigii
aan kugu amray inaad halkaas ku qariso. 7 Markaasaan
Webi Yufraad tegey, oo intaan qoday ayaan guntigii ka
soo bixiyey meeshii aan ku qariyey, oo bal eeg, guntigii
wuu ba'ay, oo waxba ma taraynin. 8 Markaasaa eraygii
Rabbigu ii yimid oo wuxuu igu yidhi, 9 Rabbigu wuxuu
leeyahay, Sidaas oo kale ayaan u bi'in doonaa kibirka dadka
Yahuudah, iyo kibirka weyn oo Yeruusaalemba. 10 Dadkan
sharka ah, oo diida inay erayadayda maqlaan, oo iska
daba gala caasinimada qalbigooda, oo raaca ilaahyo kale
inay iyaga u adeegaan oo caabudaan, waxay kulligood
noqon doonaan sida guntigan aan waxba taraynin oo kale.
11 Waayo, Rabbigu wuxuu leeyahay, Sida guntigu ugu
dhegsan yahay nin dhexdiis, sidaas oo kalaan uga dhigay
inay aniga iigu dhegsanaadaan dadka Israa'iil oo dhan iyo
dadka Yahuudah oo dhammuba, inay ii ahaadaan dad, iyo
magac, iyo ammaan, iyo sharafba, laakiinse iyagu way i
maqli waayeen innaba. 12 Sidaas daraaddeed waxaad iyaga
u sheegtaa eraygan, oo waxaad ku tidhaahdaa, Rabbiga
ah Ilaaha reer binu Israa'iil wuxuu leeyahay, Sibraar kasta
waxaa laga buuxin doonaa khamri, iyaguna waxay kugu
odhan doonaan, War sida runta ah miyaannan ogayn in
sibraar kastaba khamri laga buuxin doono? 13 Oo markaas
waxaad iyaga ku tidhaahdaa, Rabbigu wuxuu leeyahay, Bal
ogaada, dadka dalkan deggan oo dhan iyo xataa boqorrada
carshigii Daa'uud ku fadhiya, iyo wadaaddada, iyo nebiyada,
iyo dadka Yeruusaalem deggan oo dhanba waxaan ka
wada buuxin doonaa sakhraannimo. 14 Oo Rabbigu wuxuu
leeyahay, Midba mid kalaan ku garaaci doonaa, xataa
aabbayaasha iyo wiilashoodaba. Oo innaba uma aan nixi
doono, umana aan tudhi doono, umana aan naxariisan
doono, waanan wada baabbi'in doonaa. 15 Maqla, oo dheg u
dhiga, hana kibrina, waayo, Rabbigu wuu hadlay. 16 Rabbiga
Ilaahiinna ah ammaana intuusan gudcur idinku soo dejin,
iyo intaan cagihiinnu ku turunturoon buuraha gudcurka ah,
oo intaad iftiin sugaysaan uusan idiinku beddelin hooskii
dhimashada iyo gudcur dam ah. 17 Laakiinse haddaad maqli
weydaan, naftaydu meel qarsoon bay kibirkiinna aawadiis u
ooyi doontaa, oo indhahayguna aad bay u ooyi doonaan, oo
ilmaa ka soo daadan doonta, maxaa yeelay, dadkii Rabbiga
waa la kaxaystay sida adhi oo kale. 18 Oo boqorka iyo
hooyadiisa boqoradda ahba waxaad ku tidhaahdaa, Is-
hoosaysiiya, waayo, taajkii sharaftiinnu hoos buu madaxa
uga soo dhacay. 19 Magaalooyinkii koonfureed waa la
xidhay, oo cid furaysaana ma jirto. Dadka Yahuudah oo dhan
maxaabiis ahaan baa loo kaxaystay, oo kulligood maxaabiis
ahaan baa loo wada kaxaystay. 20 Indhihiinna kor u qaada,
oo bal waxaad fiirisaan kuwa woqooyi ka soo socda, bal
meeh adhigii lagu siiyey oo ah xayntaadii quruxda badnayd?
21 Bal maxaad odhan doontaa markii madax lagaaga dhigo
kuwaad bartay inay saaxiibbo kuu noqdaan? Sow xanuun
kuuma qaban doono sida naag foolanaysa? 22 Oo haddaad
qalbigaaga iska tidhaahdid, Bal maxaa waxyaalahanu iigu
dheceen? Xumaantaada badatay aawadeed ayaa darfaha
dharkaaga loo xayday oo cedhbahaagiina loo qaawiyey. 23
Miyaa Xabashi midabkiisa beddeli karaa, shabeelse miyuu
barihiisa beddeli karaa? Markaas idinka xumaanta u bartayba
wanaag baad samayn kari doontaan. 24 Sidaas daraaddeed
ayaan kala firdhin doonaa sida dabaysha cidladu ay xaab
baabba'aya u kala firdhiso oo kale. 25 Rabbigu wuxuu
leeyahay, Tanu waa qaybtaada oo ah intii aan kuu qiyaasay,
maxaa yeelay, waad i illowday, oo been baad isku hallaysay.
26 Sidaas daraaddeed darfaha dharkaagaan xaydi doonaa
ilaa wejigaaga si ay ceebtaadu u muuqato aawadeed. 27
Waan arkay sinadaadii, iyo dananiddaadii, iyo wasakhnimadii
dhillanimadaada kuwaasoo ahaa karaahiyadaadii aad kuraha
iyo berrinkaba ku samaysay. Yeruusaalemay, adigaa iska
hoogay! Ilaa goormaad diidaysaa inaad nadiifsanaato?

14 Kanu waa Eraygii Rabbiga ee abaarta ku saabsanaa
ee Yeremyaah u yimid. 2 Dadka dalka Yahuudah way
barooranayaan, irdahoodii way jilceen, oo iyagoo ooyaya
ayay dhulka fadhiyaan, oo Yeruusaalem qayladeeduna kor
bay u kacaysaa. 3 Oo kuwooda waaweyn ayaa yaryarkooda
biyo u soo dira, oo waxay yimaadaan ceelasha, biyona
kama ay helaan, oo weelashooda oo madhan ayay dib
ula soo noqdaan, oo intay ceeboobaan oo qasmaan ayay

madaxa hagoogtaan. 4 Dhulkii wuu dildillaacay, waayo,
roob kuma di'in, oo taas darteed raggii beerta qodan
jiray ayaa ceebooba, oo madaxay hagoogtaan. 5 Oo
xataa deeradii duurkay ku dhashaa, oo ilmaheedana way
dayrisaa, maxaa yeelay, meeshaasu caws ma leh innaba.
6 Oo dameerdibadeedyadana waxay istaagaan meelaha
dhaadheer, oo waxay u hinraagaan sida dawacooyin oo kale.
Indhahoodii way madoobaanayaan, maxaa yeelay, doog bay
waayayaan. 7 Rabbiyow, in kastoo ay xumaatooyinkayagu nagu
marag furayaan, magacaaga aawadiis wax u samee, waayo,
dibunoqoshadayadu way badan tahay, oo adigaannu kugu
dembaabnay. 8 Rajadii reer binu Israa'iilow, Badbaadiyahoodii
wakhtiga ay dhibaataysan yihiinow, bal maxaad dalka
dhexdiisa ugu noqonaysaa qariib iyo sidii nin socdaal ah
oo u soo leexda inuu habeen ku hoydo? 9 Bal maxaad u
noqonaysaa sidii nin amankaagay, iyo sidii nin xoog badan
oo aan waxba badbaadin karin? Laakiinse Rabbiyow, adigu
waad na dhex joogtaa, oo annana magacaagaa naloogu
yeedhaa, haddaba ha naga tegin. 10 Rabbigu wuxuu dadkan
ka leeyahay, Waxay jeclaadeen inay warwareegaan, oo
cagahoodana ma ay celin, sidaas daraaddeed Rabbigu iyaga
ma aqbalo. Haatan wuu soo xusuusan doonaa xumaantoodii,
oo dembiyadoodana wuu ciqaabi doonaa. 11 Oo Rabbigu
wuxuu igu yidhi, Dadkan wax wanaagsan ha ugu ducayn. 12
Markay soomaan qayladooda innaba ma aan maqli doono,
oo markay qurbaan la gubo iyo qurbaan hadhuudh ah ii soo
bixiyaanna innaba ma aan aqbali doono, laakiinse waxaan
iyaga ku baabbi'in doonaa seef, iyo abaar, iyo belaayo. 13
Markaasaan idhi, Sayidow, Rabbiyow, bal eeg, nebiyadiiba
waxay ku yidhaahdaan, Seef arki maysaan, abaaruna idinku
dhici mayso, laakiinse waxaan meeshan idinku siin doonaa
nabad hubaal ah. 14 Markaasaa Rabbigu igu yidhi, Nebiyadu
wax been ah ayay magacayga ku sii sheegaan. Anigu
sooma aan dirin, soomana aan amrin, lamana aan hadlin
innaba. Waxay idiin sii sheegaan riyo been ah, iyo faal,
iyo wax aan waxba ahayn, iyo khiyaanadii qalbigooda. 15
Sidaas daraaddeed Rabbigu wuxuu nebiyadaas ka leeyahay,
Nebiyada magacayga wax ku sii sheega, oo aanan soo
dirin, laakiinse yidhaahda, Seef iyo abaar toona dalkan
dhexdiisa laguma arki doono, waxaa baabbi'in doona seef
iyo abaar. 16 Oo dadka ay wax u sii sheegaanna waxaa
lagu tuuri doonaa jidadka Yeruusaalem, waana abaar iyo
seef daraaddood, oo ciduna ma ay xabaali doonto iyaga, iyo
naagahooda, iyo wiilashooda, iyo gabdhahoodaba, waayo,
waxaan iyaga ku soo dejin doonaa xumaantoodii oo dhan.
17 Waxaad iyaga ku tidhaahdaa erayadan, Habeen iyo
maalinba indhahayga ilmo ha ka hoorto, oo yaanay marnaba
joogsan, waayo, dadkayga oo ah sida gabadh bikrad ah
nabar weyn baa ku dhacay iyo dhaawac aad iyo aad u
xun. 18 Haddaan duurka tago waxaan arkaa kuwa seef lagu
laayay, oo haddaan magaalada galona waxaa arkaa kuwa
gaajo la buka, waayo, nebiyadii iyo wadaaddadiiba dalkay ku
dhex warwareegaan iyagoo aan aqoon lahayn. 19 Rabbiyow,
aslanba dalka Yahuudah ma nacday? Naftaadu Siyoon ma
karahday? Bal maxaad wax noogu dhufatay oo aannu u
bogsan waynay? Nabad baannu filanaynay, laakiinse wax
wanaagsanina ma iman, oo waxaannu filanaynay wakhti
caafimaad leh, laakiinse waxaa noo timid cabsi keliya! 20
Rabbiyow, annagu waannu aqoonsannaa sharnimadayada
iyo xumaantii awowayaashayoba, waayo, waannu kugu
dembaabnay. 21 Magacaaga aawadiis waan ku baryayaaye,
Ha na karaahsan oo arshigii sharaftaadana ha sharafjebin,
bal na soo xusuuso, oo ha nagu axdi furin. 22 Sanamyada
beenta ah oo quruumaha miyaa lagu arkaa mid roob keeni
kara? Amase samooyinku miyey iska soo tiixi karaan?
Rabbiyow Ilaahayagow, sow adigu ma tihid kan kara? Sidaas
daraaddeed adiga uun baan ku sugaynaa, waayo, adigaa
sameeyey waxyaalahaas oo dhan.

**15** Markaasaa Rabbigu igu yidhi, Xataa haddii Muuse
iyo Samuu'eel ay hortayda soo istaagaan, qalbigaygu
innaba dadkan uma soo noqon kareen. Hortayda ka
fogee iyaga, oo iska daa ha tageene. 2 Oo markay
kugu yidhaahdaan, Xaggee baannu tegaynaa? waxaad
ku tidhaahdaa, Rabbigu wuxuu idinku leeyahay, Kuwii
dhimashadu waajib ku tahay xagga dhimashada ha tageen,
kuwii seeftu xagga seefta, kuwii abaartu xagga abaarta, oo
kuwii maxaabiisnimadu xagga maxaabiisnimada. 3 Rabbigu
wuxuu leeyahay, Waxaan korkooda ku soo dayn doonaa
belaayo afar cayn ah, waana in seeftu disho, oo eeydu
kala dildillaacsadaan, oo haadka samada iyo dugaagga
dhulku ay wada laastaan oo ay baabbi'iyaan. 4 Manaseh
ina Xisqiyaah oo ahaa boqorkii dalka Yahuudah wixii uu
Yeruusaalem ku dhex sameeyey daraaddood ayaan ka dhigi
doonaa inay iyagu boqortooyooyinka dunida oo dhan ku
dhex rogrogmadaan hore iyo dib. 5 Waayo, Yeruusaalemay,
bal yaa kuu tudhi doona? Yaase kuu barooran doona?
Yaase u soo leexan doona inuu sidaad tahay weyddiiyo?
6 Rabbigu wuxuu leeyahay, Waad iga tagtay, oo dib baad
u noqotay, sidaas daraaddeed gacantaydaan kugu soo
fidiyey, waanan ku baabbi'iyey, waayo, inaan ciqaabiddaada
ka noqdo waan ka daalay. 7 Dalka irdihiisa ayaan iyaga
masaf kaga haadiyey, waanan gablamiyey, dadkaygana
waan baabbi'iyey, waayo, jidadkoodii kama ay soo noqon.

8 Tiradii carmalladooda waan ka sii badiyey cammuudda
badaha, oo barbaarrada hooyooyinkood waxaan hadhkii
ku soo daayay baabbi'iye. Waxaan si kedis ah ugu dejiyey
cidhiidhi iyo cabsi. 9 Rabbigu wuxuu leeyahay, Tii toddoba
wiil dhashay way caatowday, oo naftiina way ka baxday.
Gabbalkeediina waa dhacay iyadoo ay weli maalin tahay.
Way ceebowday, wayna wareertay, oo kuwooda hadhayna
waxaan u gacangelin doonaa seefta cadaawayaashooda.
10 Anigaa iska hoogay, hooyoy, waxaad ii dhashay inaan
dunida oo dhan u ahaado nin rabshad iyo dirir miidhan!
Weligay ninna korsocod wax uma deymin, oo ninna korsocod
wax kama deyman, laakiinse mid kastaaba waa i habaaraa.
11 Rabbigu wuxuu yidhi, Sida runta ah waad nabdoonaan
doontaa, sida runta ah waxaan ka dhigi doonaa in cadowgu
ku baryo wakhtigii masiibo jirto iyo wakhtigii dhib jiro. 12
Miyaa bir la jebin karaa, xataa birta woqooyi, iyo naxaasta?
13 Maalkaaga iyo khasnadahaaga waxaan u wada bixin
doonaa sidii boolida aan loo iibsan, waana dembigaagii
aad waddankaaga oo dhan ku dhex samaysay daraaddiis.
14 Oo waxaan ka dhigi doonaa inaad cadaawayaashaada
ula gudubtid dal aadan innaba aqoonin, waayo, waxaa
xanaaqaygii ka ololay dab idin gubi doona. 15 Rabbiyow,
wax kastaba waad og tahay, haddaba bal i soo xusuuso, oo
i soo booqo, oo iiga aargud kuwa i silcinaya. Ii dulqaado oo
ha i fogayn. Ogow inaan aawadaa cay ugu adkaystay. 16
Rabbiyow, Ilaaha ciidammadow, erayadaadii waa la helay, oo
waan cunay, oo erayadaadu waxay ii ahaayeen farxaddii iyo
rayrayntii qalbigayga, waayo, magacaagaa la iigu yeedhaa.
17 Ma aanan dhex fadhiisan shirka kuwa wax ku qosla, oo
ma aanan rayrayn innaba, laakiinse keligay baan gooni
u fadhiistay gacantaada i dul saaran aawadeed, waayo,
waxaad iga buuxisay dhirif. 18 Bal maxaa xanuunkaygu
had iyo goor u sii jiraa, nabarkayguse bal muxuu la raysan
waayaa, oo inuu bogsado u diidaa? Sida xaqiiqada ah ma
waxaad ii noqonaysaa sidii durdur been ah, iyo sidii biyo sii
gudhaya oo kale? 19 Sidaas daraaddeed Rabbigu wuxuu
leeyahay, Haddaad soo noqotid, waan ku soo celin doonaa,
oo hortaydaad istaagi doontaa. Oo haddaad waxyaalaha
qaaliga ah nijaasta ka soocdidna waxaad noqon doontaa
sida afkayga oo kale. Iyagu waa inay kuu soo noqdaan,
laakiinse adigu waa inaadan xaggooda u noqon. 20 Rabbigu
wuxuu leeyahay, Waxaan dadkan kaaga dhigi doonaa derbi
adag oo naxaas ah. Way kula diriri doonaan, laakiinse kaama
ay adkaan doonaan innaba, waayo, waan kuula jiraa inaan
ku badbaadsho oo aan ku samatabbixiyo. 21 Oo waxaan
kaa samatabbixin doonaa gacanta sharrowyada, waanan
kaa badbaadin doonaa gacanta kuwa laga cabsado.

16 Oo haddana Eraygii Rabbiga ayaa ii yimid oo wuxuu
igu yidhi, 2 Naag ha guursan, oo wiilal iyo gabdho
toona meeshan ha ku yeelan. 3 Waayo, Rabbigu wuxuu
ka leeyahay wiilasha iyo gabdhaha meeshan ku dhalan
doona, iyo hooyooyinka iyaga dhali doona, iyo aabbayaasha
iyaga dalkan ku dhex dhali doonaba, 4 Waxay u dhiman
doonaan dhimasho xun, oo looma barooran doono, lamana
xabaali doono, laakiinse sidii digo dhulka daadsan oo kale
ayay noqon doonaan, oo waxay ku baabbi'i doonaan seef
iyo abaar, oo baqtigooduna cunto buu u noqon doonaa
haadka samada iyo dugaagga dhulkaba. 5 Waayo, Rabbigu
wuxuu leeyahay, Gurigii tacsiyu taal ha gelin, iyaga ha
u barooran, hana u tacsiyayn, waayo, Rabbigu wuxuu
leeyahay, Dadkan nabaddaydii waan ka fogeeyey iyo xataa
raxmad iyo naxariisba. 6 Oo kuwa waaweyn iyo kuwa
yaryaruba dalkanay ku dhex dhiman doonaan. Lama xabaali
doono, loomana barooran doono, laysumana googooyn
doono, oo iyaga aawadoodna laysuma xiiri doono. 7 Oo
ciduna iyaga uma jejebin doonto kibistii axanka inay uga
tacsiyeeyaan kii dhintay, oo ciduna iyaga ma siin doonto
koobkii tacsida inay aabbahood ama hooyadood u cabbaan.
8 Oo weliba waa inaadan innaba u gelin gurigii diyaafadu
taal inaad iyaga la fadhiisatid oo aad wax la cuntid, waxna la
cabtid. 9 Waayo, Rabbiga ciidammada oo ah Ilaaha reer binu
Israa'iil wuxuu leeyahay, Bal ogow, indhahaaga hortooda
iyo wakhtiga aad nooshahay qudhiisa waxaan meeshan ka
joojin doonaa codka rayraynta iyo codka farxadda, iyo codka
arooska iyo codka aroosaddaba. 10 Oo markaad dadkan
u sheegtid erayadan oo dhan oo ay kugu yidhaahdaan,
Bal maxaa Rabbigu noogaga hadlay masiibadan weyn?
Amase waa maxay xumaantayadu? Amase waa maxay
dembigii aannu Rabbiga Ilaahayaga ah ku samaynay? 11
markaas waxaad iyaga ku tidhaahdaa, Rabbigu wuxuu
leeyahay, Awowayaashiin way iga tageen, oo waxay daba
galeen ilaahyo kale, wayna u adeegeen oo caabudeen, oo
anigana way iga tageen, oo sharcigaygiina ma ay dhawrin,
12 oo idinkuna waxaad samayseen shar ka sii daran kii
ay awowayaashiin sameeyeen, waayo, bal eega, midkiin
kastaaba wuxuu daba socdaa caasinimada qalbigiisa sharka
ah, anigana ma aydaan maqlin. 13 Oo sidaas daraaddeed
dalkan waan idinka xoori doonaa oo waxaan idinku dhex tuuri
doonaa dal aydaan aqoonin idinka iyo awowayaashiin toona,
oo halkaasaad ilaahyo kale ugu adeegi doontaan habeen
iyo maalinba, oo aniguna innaba raalli idinkama ahaan
doono. 14 Sidaas daraaddeed Rabbigu wuxuu leeyahay,
Bal ogaada, waxaa soo socda wakhti aan mar dambe la
odhan doonin, Waxaa nool Rabbigii reer binu Israa'iil dalkii

Masar ka soo bixiyey, 15 laakiinse waxaa la odhan doonaa,
Waxaa nool Rabbigii reer binu Israa'iil ka soo bixiyey dalkii
woqooyi iyo dalalkii uu u kexeeyey oo dhan. Oo aniguna
waxaan iyaga mar kale ku soo celin doonaa dalkoodii aan
awowayaashood siiyey. 16 Rabbigu wuxuu leeyahay, Bal
eega, waxaan iyaga u soo diri doonaa kalluumaystayaal
badan oo iyana way soo qabsan doonaan, oo haddana
waxaan u soo diri doonaa ugaadhsadayaal badan, oo iyana
way ka ugaadhsan doonaan buur kasta, iyo kur kasta,
iyo boholaha dhagaxyada oo dhan. 17 Waayo, jidadkooda
oo dhan indhahaan ku hayaa, oo igamana ay qarsoona,
xumaantooduna kama ay daboolna indhahayga. 18 Marka
ugu horraysa waxaan laba jibbaar uga abaalmarin doonaa
xumaantoodii iyo dembigoodii, maxaa yeelay, dalkaygii
waxay ku nijaaseeyeen bakhtiyada sanamyadoodii la nacay,
oo dhaxalkaygiina waxay ka buuxiyeen karaahiyadooda. 19
Rabbiyow, xooggaygii, iyo qalcaddaydii, iyo magangalkaygii
aan maalinta dhibaatada magangalow, quruumuhu way
kaaga iman doonaan dhulka darafyadiisa ugu shisheeya, oo
waxay odhan doonaan, Sida xaqiiqada ah awowayaashayo
waxba ma dhaxlin been, iyo wax aan waxtar lahayn, iyo
waxyaalo aan innaba faa'iido lahayn mooyaane. 20 Bal nin
miyuu samaysan karaa ilaahyo aan Ilaah ahayn? 21 Sidaas
daraaddeed bal ogaada, waxaan iyaga ogeysiin doonaa
gacantayda iyo xooggayga, markan keliya ayaan ogeysiin
doonaa, oo waxay ogaan doonaan in magacaygu Rabbi
yahay.

**17** Dembigii dadka Yahuudah waxaa lagu qoray qalin bir
ah iyo caarad dheemman, oo waxaa lagu xardhay
looxa qalbigooda iyo geesaha meelahooda allabariga, 2 inta
ay carruurtoodu xusuusan yihiin meelahoodii allabariga iyo
geedahoodii Asheeraah ee ku yiil geedaha cagaarka ah
dhinacooda iyo kuraha dhaadheer dushooda. 3 Buurtayda
duurka ku dhex taalay, maalkaaga iyo khasnadahaaga oo
dhan, iyo meelahaaga dhaadheer, waxaan booli ahaan
uga bixin doonaa soohdimahaaga oo dhan dembigaaga
aawadiis. 4 Oo adiga qudhaadu waad sii dayn doontaa
dhaxalkii aan ku siiyey, oo inaad cadaawayaashaada ugu
adeegtid dal aadan weligaa aqoonin ayaan ka dhigi doonaa,
waayo, waxaad cadhadaydii ku dhex shidday dab weligiisba
sii ololaya. 5 Rabbigu wuxuu leeyahay, Ninkii nin isku
halleeya oo binu-aadmiga gacan ka dhigta, oo qalbigiisu
Rabbiga ka tegey, waa inkaaran yahay. 6 Waayo, wuxuu
ahaan doonaa sida geed xun oo lamadegaanka ku yaal,
oo mana uu arki doono markii wanaag imanayo, laakiinse
wuxuu joogi doonaa meelo engegan oo cidlada dhexdeeda
ah, oo ah dal cusba ah oo aan ciduna degganayn. 7 Waxaa
barakaysan ninkii Rabbiga isku halleeya, oo rajadiisuna ay
Rabbiga tahay. 8 Waayo, wuxuu ahaan doonaa sida geed
lagu beeray biyaha dhinacooda oo xididdihiisa u fidsaday
webiga dhiniciisa, oo kulaylku markuu yimaado kama cabsan
doono, laakiinse caleentiisu cagaar bay iska ahaan doontaa,
oo sannadda abaarta ah innaba ma uu welweli doono,
mana uu joojin doono midhobixintiisa. 9 Qalbiga dadku wax
kasta buu ka khiyaano badan yahay, oo aad iyo aad buu
u xun yahay, bal yaa garan kara? 10 Aniga Rabbiga ah
ayaa qalbiga baadha, anigaa kelyaha imtixaama, si aan nin
kastaba ugu abaalmariyo sidii jidkiisu ahaa iyo sidii midhaha
falimihiisu ahaayeen. 11 Kii si aan xaq ahayn maal ku soo
urursadaa wuxuu la mid yahay digaagduurta ku dul fadhida
ugxan ayan dhalin, oo wuxuu ka tegi doonaa kalabadhka
cimrigiisa, oo ugudambaystiisana nacas buu ahaan doonaa.
12 Meeshayada quduuska ahu waa carshi sharaf badan oo
tan iyo bilowgii sarreeyey. 13 Rabbiyow, rajadii reer binu
Israa'iilow, kuwa kaa taga oo dhammu way wada ceeboobi
doonaan. Kuwii iga taga dhulkaa lagu qori doonaa, waayo,
waxay ka tageen Rabbiga ah ishii biyaha nool. 14 Rabbiyow,
i bogsii, oo anna waan bogsan doonaa, i badbaadi, oo
anna waan badbaadi doonaa, waayo, adigu waxaad tahay
ammaantaydii. 15 Bal eeg, iyagu waxay igu yidhaahdaan,
Eraygii Rabbigu meeh? Haddaba haatan ha yimaado! 16
Inaan ku addeeco oo aan adhijir sii ahaado kama aanan
degdegin, oo maalinta hooggana ma aanan jeclaysan.
Taas waad og tahay. Oo wax alla wixii bushimahayga ka
soo baxayba hortaadaan ku idhi. 17 Cabsi ha ii noqonin,
waayo, maalinta masiibada waxaad tahay magangalkii aan
magangalo. 18 Kuwa i silciya ha ceeboobeen, laakiinse
anigu yaanan ceeboobin, oo iyagu ha nexeen, laakiinse
anigu yaanan nixin. Maalinta masiibada ku soo deji, oo
waxaad iyaga ku halligtaa halligaad laba jibbaar ah. 19
Rabbigu wuxuu igu yidhi, Tag oo waxaad istaagtaa iridda
dadka oo ay boqorrada dalka Yahuudah ka soo galaan
kana baxaan, iyo weliba irdaha Yeruusaalem oo dhanba.
20 Oo waxaad iyaga ku tidhaahdaa, Bal erayga Rabbiga
maqla, boqorrada dalka Yahuudah, iyo dadka Yahuudah oo
dhan, iyo dadka Yeruusaalem deggan oo irdahan ka soo
gala oo dhammow. 21 Rabbigu wuxuu leeyahay, Isdhawra,
oo maalinta sabtida innaba rar ha qaadina, oo irdaha
Yeruusaalemna ha soo gelinina, 22 oo maalinta sabtidana
guryihiinna rar ha ka bixinina, oo innaba wax shuqul ah ha
samaynina, laakiinse maalinta sabtida waxaad quduus uga
dhigtaan sidaan awowayaashiin ku amray. 23 Laakiinse ma
ay maqlin, oo dhegna uma ay dhigin, illowse way madax

adkaadeen, si ayan u maqlin, ama ayan waano u qaadan.
24 Laakiinse Rabbigu wuxuu leeyahay, Haddaad aad ii
maqashaan, oo aydaan maalinta sabtida innaba rar soo
gelin irdaha magaaladan, laakiinse aad maalinta sabtida
quduus ka dhigtaan, oo aydaan maalintaas innaba wax
shuqul ah samayn, 25 markaas boqorro iyo amiirro carshigii
Daa'uud ku fadhiisan doona ayaa irdaha magaaladan soo
geli doona iyagoo fuushan gaadhifardood iyo fardo, iyaga,
iyo amiirradooda, iyo dadka dalka Yahuudah, iyo kuwa
Yeruusaalem degganba, oo magaaladanna weligeedba
waa la sii degganaan doonaa. 26 Oo waxay ka iman
doonaan magaalooyinka dalka Yahuudah, iyo meelaha
Yeruusaalem ku wareegsan, iyo dalka reer Benyaamiin,
iyo dalka hoose, iyo buuraha, iyo xagga koonfureedba, oo
waxay guriga Rabbiga keeni doonaan qurbaanno la gubo,
iyo allabaryo, iyo qurbaanno hadhuudh ah, iyo foox, iyo
allabaryo mahadnaqid loo keeno. 27 Laakiinse haddaad i
maqli weydaan inaad maalinta sabtida quduus ka dhigtaan,
iyo inaydaan maalinta sabtida rar qaadin markaad irdaha
Yeruusaalem soo gelaysaan, markaas anigu dab baan ku sii
dayn doonaa irdaheeda, oo isna wuxuu baabbi'in doonaa
daaraha waaweyn oo Yeruusaalem, oo innaba lama demin
doono.

18 Kanu waa eraygii Yeremyaah xagga Rabbiga uga
yimid, isagoo leh, 2 Kac, oo waxaad tagtaa
guriga dheryasameeyaha, oo halkaasaan erayadayda
kugu maqashiin doonaa. 3 Markaasaan xaggii gurigii
dheryasameeyaha tegey, oo bal eeg, waxaan arkay isagoo
giringiro shuqulkiisa ku samaynaya. 4 Oo markii weelkii uu
dheryasameeyuhu dhoobada ka samaynayay gacantiisii
ku kharribmay ayuu dheryasameeyihii haddana weel kale
sameeyey sidii isaga la wanaagsanayd. 5 Markaas waxaa ii
yimid Eraygii Rabbiga oo leh, 6 Rabbigu wuxuu leeyahay,
Dadka Israa'iilow, miyaanan idinku samayn karin sida
dheryasameeyuhu yeelay oo kale? Dadka Israa'iilow, bal
ogaada, idinku waxaad gacantayda ugu jirtaan sida dhoobadu
gacanta dheryasameeyaha ugu jirto oo kale. 7 Mar alla
markaan ku hadlo wax ku saabsan quruun ama boqortooyo,
inaan iyaga rujiyo, oo aan dumiyo, oo aan baabbi'iyo, 8
haddii dadka quruuntaas aan ka hadlay ay sharkooda ka soo
noqdaan, aniguna waan ka soo noqon doonaa masiibadii aan
ku fikiray inaan ku sameeyo. 9 Oo mar alla markaan ku hadlo
wax ku saabsan quruun ama boqortooyo inaan iyada dhiso oo
aan beero, 10 hadday wax shar ah hortayda ku sameeyaan,
oo ay codkayga addeeci waayaan, markaas anigu waan ka
soo noqon doonaa wanaaggii aan ugu talaggalay. 11 Haddaba
sidaas daraaddeed tag, oo waxaad la hadashaa dadka
dalka Yahuudah iyo kuwa Yeruusaalem deggan, oo waxaad
ku tidhaahdaa, Rabbigu wuxuu leeyahay, Bal ogaada,
anigu masiibaan idiin qabanqaabinayaa, oo hindisaan idiin
hindisayaa. Haddaba midkiin kastaaba jidkiisa sharka ah ha
ka soo noqdo, oo jidadkiinna iyo falimihiinnaba wanaajiya. 12
Laakiinse iyagu waxay leeyihiin, Taas ha ka yaabin, annagu
waxaannu iska daba soconaynaa hindisooyinkayaga, oo
midkayo kastaaba wuxuu samayn doonaa caasinimada
qalbigiisa sharka ah. 13 Sidaas daraaddeed Rabbigu wuxuu
leeyahay, Quruumaha waxaad ka dhex weyddiisaan, Bal
yaa waxyaalahan oo kale maqlay? Dadka Israa'iil oo bikrad
ah waxay sameeyeen wax aad iyo aad u xun. 14 Barafka
cad ee Lubnaan miyaa laga waayaa dhagaxa duurka?
Miyaase biyaha qabow oo meel fog ka soo qulqulaya iska
gudhaan? 15 Hase ahaatee dadkaygii way i illoobeen, oo
waxay foox u shideen waxyaalo aan waxba ahayn, oo waxay
ku dhex turunturoodeen jidadkoodii ahaa waddooyinkii hore,
wayna ka leexdeen, oo waxay ku socdeen dhabbayaal
qalloocan iyo jid aan jidka weyn ahayn, 16 si ay dalkoodii
uga dhigaan cidla laga yaabo iyo wax had iyo goorba lagu
foodhyo. Mid kasta oo ag maraaba wuu yaabi doonaa, oo
madaxuu luli doonaa. 17 Anigu waxaan iyaga cadowgooda
ugu hor firdhin doonaa sidii iyagoo dabayl bari kaxaysay,
oo maalintii masiibadoodana waxaan u jeedin doonaa
dhabarka, oo innaba wejiga tusi maayo. 18 Oo markaas
waxay yidhaahdeen, Ina keena aynu Yeremyaah shirqool u
hindisnee, waayo, sharcigu wadaadka ka tegi maayo, oo
taladuna kii xigmad leh ka tegi mayso, oo erayguna nebiga
ka tegi maayo. Ina keena aynu isaga carrabka ku dhufannee,
oo erayadiisana yeynan innaba dheg u dhigin. 19 Rabbiyow,
bal i maqal, oo bal dhegayso kuwa ila diriraya codkooda.
20 Wanaag miyaa loogu abaalgudaa shar? Waayo, iyagu
god bay u qodeen naftayda. Bal xusuuso inaan hortaada
u istaagay inaan iyaga aawadood wanaag kaa baryo, iyo
inaan cadhadaada iyaga ka leexiyo. 21 Haddaba sidaas
daraaddeed carruurtooda abaar u gacangeli, oo waxaad
iyaga u gudbisaa xoogga seefta, oo naagahooduna ha
gablameen, oo carmallo ha noqdeen, oo raggoodana ha
la laayo, oo barbaarradoodana seef ha lagu dilo dagaalka
dhexdiisa. 22 Markaad col sii dhaqsiya ugu soo daysid, qaylo
ha ka dhex yeedho guryahooda, waayo, god bay ii qodeen,
oo shirqool bay cagahayga u qariyeen. 23 Rabbiyow, adigu
waad og tahay taladooda oo dhan iyo siday u doonayaan
inay i dilaan. Xumaantooda ha ka cafiyin, oo dembigoodana
hortaada ha ka tirtirin, laakiinse hortaada ha lagu afgembiyo,
oo wakhtiga cadhadaadana sidaas ula macaamilo.

19 Rabbigu wuxuu igu yidhi, Tag, oo dheryasameeye
jalxaddiis soo iibso, oo intaad qaar ka mid ah odayaasha
dadka iyo odayaasha wadaaddada soo kaxaysid, 2 waxaad
tagtaa dooxada ina Xinnom oo u dhow meesha laga soo galo
iridda Xarsiid, oo halkaas erayada aan kuu sheegi doono ka
naadi, 3 adoo leh, Boqorrada dalka Yahuudah iyo dadka
Yeruusaalem degganow, bal maqla erayga Rabbiga. Rabbiga
ciidammada oo ah Ilaaha reer binu Israa'iil wuxuu leeyahay,
Bal ogaada, meeshan masiibaan ku soo dejin doonaa, oo ku
alla kii maqlaaba wuu ka nixi doonaa. 4 Iyagu way iga tageen,
oo intay meeshan nijaaseeyeen, ayay foox ugu shideen
ilaahyo kale oo iyaga, iyo awowayaashood, iyo boqorrada
dalka Yahuudahba ayan aqoon, oo waxay meeshan ka
buuxiyeen dhiigga kuwa aan xaqa qabin. 5 Oo waxay dhiseen
meelaha sarsare ee Bacal inay wiilashooda dab ku gubaan
oo ay Bacal qurbaanno la gubo ugu bixiyaan, taasoo aanan
ku amrin, oo aanan ku hadlin, oo aan innaba qalbigayga
soo gelin. 6 Sidaas daraaddeed Rabbigu wuxuu leeyahay,
Bal ogaada, waxaa iman doona wakhti aan meeshan mar
dambe loogu yeedhi doonin Tofed, amase dooxadii ina
Xinnom, laakiinse waxaa lagu magacaabi doonaa Dooxadii
Gowracidda. 7 Oo waxaan meeshan ka tirtiri doonaa talada
dadka Yahuudah iyo dadka Yeruusaalemba, oo waxaan ka
dhigi doonaa inay cadaawayaashooda hortooda ku la'daan
oo ay ku dhintaan gacanta kuwa naftooda doondoonaya, oo
bakhtigoodana waxaan cunto ahaan u siin doonaa haadka
samada iyo dugaagga dhulka. 8 Oo magaaladanna waxaan
ka dhigi doonaa cidla laga yaabo iyo wax lagu foodhyo,
oo mid kasta oo ag maraaba wuu ka yaabi doonaa oo ku
foodhyi doonaa belaayooyinkeeda oo dhan aawadood. 9 Oo
waxaan ka dhigi doonaa inay cunaan hilibka wiilashooda iyo
hilibka gabdhahoodaba, oo midkood kastaaba wuxuu cuni
doonaa hilibka saaxiibkiis markii dagaal lagu hareereeyo oo
ay ku cidhiidhsanaadaan cidhiidhiga cadaawayaashooda iyo
kuwa naftooda doondoonaya ay ku cidhiidhin doonaan. 10
Oo markaas jalxadda waxaad ku jebisaa raggii kula socda
hortooda. 11 Oo waxaad iyaga ku tidhaahdaa, Rabbiga
ciidammadu wuxuu leeyahay, Dadkan iyo magaaladanba
waxaan u jejebin doonaa sida weelka dheryasameeyaha loo
jebiyo oo kale, kaasoo aan mar kale la kabi karayn, oo waxaa
meydadkooda lagu wada xabaali doonaa Tofed, ilamaa ay
waayaan meel ay ku kala xabaalaan. 12 Rabbigu wuxuu
leeyahay, Sidaasaan meeshan ku samayn doonaa, iyada iyo
dadka dhex degganba, oo magaaladanna waxaan ka dhigi
doonaa sida Tofed oo kale, 13 oo guryaha Yeruusaalem
iyo guryaha boqorrada dalka Yahuudah ee nijaasaysan
waxay u ahaan doonaan sida meesha Tofed oo kale, xataa
guryahaas oo ah kuwii saqafkooda oo dhan foox loogu shidi
jiray ciidammada samada oo dhan, oo qurbaanno cabniin ah
loogu bixin jiray ilaahyo kale. 14 Markaas Yeremyaah wuxuu
ka yimid Tofed oo ah meeshii Rabbigu u diray inuu wax ku
sii sheego, oo intuu barxaddii guriga Rabbiga soo istaagay
ayuu dadkii oo dhan ku yidhi, 15 Rabbiga ciidammada oo
ah Ilaaha reer binu Israa'iil wuxuu leeyahay, Bal ogaada,
waxaan magaaladan iyo tuulooyinkeeda oo dhanba ku soo
dayn doonaa masiibadii aan markii hore kaga hadlay oo
dhan, maxaa yeelay, way sii madax adkaadeen, si ayan
erayadayda u maqlin aawadeed.

20 Haddaba Fashxuur ina Immeer oo ahaa wadaadkii iyo
taliyihii sare ee guriga Rabbiga ayaa maqlay Yeremyaah
oo waxyaalahaas sii sheegaya. 2 Markaasaa Fashxuur
garaacay Yeremyaah, oo wuxuu geliyey jeebbooyinkii ku yiil
iridda sare oo reer Benyaamiin, oo ku tiil guriga Rabbiga. 3
Oo maalintii dambe Fashxuur ayaa Yeremyaah jeebbooyinkii
ka soo bixiyey. Markaasaa Yeremyaah isagii ku yidhi,
Rabbigu magacaaga uguma yeedhin Fashxuur, laakiinse
wuxuu kugu magacaabay Maagoor Misaabiib. 4 Waayo,
Rabbigu wuxuu leeyahay, Bal eeg, waxaan cabsi kaaga
dhigi doonaa nafsaddaada iyo saaxiibbadaa oo dhanba.
Iyana waxay ku dhiman doonaan seefta cadaawayaashooda,
oo indhahaaguna taas bay arki doonaan. Oo dadka dalka
Yahuudah oo dhanna waxaan gelin doonaa gacanta boqorka
Baabuloon, oo isna wuxuu iyaga maxaabiis ahaan ugu
kaxaysan doonaa ilaa Baabuloon, oo seef buu ku layn
doonaa. 5 Oo weliba magaaladan maalkeeda oo dhan, iyo
waxyaalihii ay ku hawshootay oo dhan, iyo waxyaalaheeda
qaaliga ah oo dhan, iyo khasnadaha boqorrada dalka
Yahuudah oo dhanba, waxaan u gacangelin doonaa
cadaawayaashooda, oo iyana way boobi doonaan, oo
intay kaxaystaan ayay Baabuloon wareejin doonaan. 6
Fashxuurow, adiga iyo inta gurigaaga deggan oo dhanba
maxaabiis ahaan baa laydiin wada kaxaysan doonaa, oo
waxaad tegi doontaa Baabuloon, oo halkaasaad ku dhiman
doontaa, oo halkaasaa lagugu xabaali doonaa, adiga, iyo
saaxiibbadaadii aad wax been ah u sii sheegi jirtay oo
dhanba. 7 Rabbiyow, waad i khiyaanaysay, oo waa lay
khiyaaneeyey, adigu waad iga xoog badan tahay, oo waad iga
adkaatay. Maalin kasta waa laygu qoslaa, oo mid kastaaba
waa i yaraystaa. 8 Waayo, mar alla markaan hadlaba
waan qayliyaa, oo waxaan ku dhawaaqaa, Waa dulmi iyo
kharribaad, maxaa yeelay, eraygii Rabbigu wuxuu ii noqday
sabab ay maalinta oo dhan igu caayaan oo iigu qoslaan. 9
Oo haddaan idhaahdo, Isaga ka hadli maayo, oo mar dambe

magiciisa wax ku sheegi maayo, waxaa qalbigayga ku jira
wax dab ololaya la moodo oo lafahayga ku dheggan, oo
waxaan la daalay hadalka. 10 Waayo, waxaan maqlay kuwa
badan oo i caayaya, iyo cabsi dhan kasta iga wareegsan. Oo
waxay yidhaahdaan, Soo ashtakeeya oo annana waannu
ashtakaynaynaa. Kuwii ila nabad ahaa oo dhammu waxay
sugayaan dhiciddayda, oo waxay yidhaahdaan, Mindhaa
isaga waa la khiyaanayn doonaa, oo waannu ka adkaan
doonnaa, oo waannu aargudan doonnaa. 11 Laakiinse
Rabbigu waa ila jiraa isagoo ah sidii mid xoog badan
oo cabsi leh, oo sidaas daraaddeed kuwa i silciyaa way
turunturoon doonaan, oo igama ay adkaan doonaan. Ma
ay liibaanin oo taas daraaddeed aad iyo aad bay ugu
ceeboobi doonaan ceeb weligeed ah oo aan marnaba la
illoobi doonin. 12 Laakiinse Rabbiga ciidammadow, waxaad
tahay kan kii xaqa ah imtixaama, oo waxaad fiirisaa kelyaha
iyo qalbigaba, haddaba bal i tus aargudashadaada oo iyaga
ku kor dhacaysa, waayo, adigaan dacwadaydii ku soo
bandhigay. 13 Rabbiga u gabya, oo Rabbiga ammaana,
waayo, isagaa naftii miskiinka ka samatabbixiyey gacantii
xumaanfalayaasha. 14 Ha inkaarnaato maalintii aan dhashay,
oo maalintii hooyaday i dhashayna yaanay barakoobin. 15 Ha
inkaarnaado ninkii aabbahay u bishaareeyey, oo isagoo ka
farxinaya ku yidhi, Wiil baa kuu dhashay! 16 Oo ninkaasu ha
noqdo sidii magaalooyinkii Rabbigu afgembiyey oo uusan u
qoomamoon. Oo aroortii oohin ha maqlo, oo hadhkiina qaylo
digtooneed ha maqlo, 17 maxaa yeelay, isagu iguma dhex
dilin uurkii hooyaday, si ay hooyaday igu ahaato qabrigaygii,
oo uu uurkeeduna u weynaado weligiisba. 18 Bal maxaan
uurkii hooyaday uga soo baxay si aan hawl iyo murug u
arko, oo uu cimrigaygu ceeb ugu dhammaado?

21 Kanu waa eraygii Yeremyaah xagga Rabbiga uga
yimid, markii Boqor Sidqiyaah uu isaga u soo diray
Fashxuur ina Malkiiyaah, iyo Safanyaah ina Macaseeyaah
oo wadaadka ahaa, isagoo leh, 2 Waan ku baryayaaye,
bal Rabbiga wax noo weyddii, waayo, Nebukadresar oo ah
boqorkii Baabuloon ayaa nala diriraya. Waxaa suurtowda
in Rabbigu nagula macaamiloodo shuqulladiisa yaabka
badan oo dhan, si uu cadowgu nooga noqdo. 3 Markaas
Yeremyaah wuxuu iyagii ku yidhi, Waxaad Sidqiyaah ku
tidhaahdaan: 4 Rabbiga ah Ilaaha reer binu Israa'iil wuxuu
leeyahay, Bal ogow, dib baan u celin doonaa hubka dagaalka
ee gacantiinna ku jira ee aad kula diriraysaan boqorka
Baabuloon, iyo reer Kaldayiinka derbiyada dibaddooda
idinku hareeraynaya, oo iyagaan magaaladan dhexdeeda
ku soo ururin doonaa. 5 Oo aniga qudhaydu waxaan
idinkula diriri doonaa gacan fidsan iyo cudud xoog badan,
anoo xanaaqsan oo cadhaysan oo aad u dhirifsan. 6 Oo
wax baan ku dhufan doonaa waxa magaaladan deggan,
dad iyo duunyaba, oo waxay ku le'an doonaan belaayo
weyn. 7 Oo waxaa Rabbigu leeyahay, Dabadeed Sidqiyaah
oo ah boqorka dalka Yahuudah, iyo addoommadiisa, iyo
dadka oo ah intii magaaladan ku hadhay oo belaayada, iyo
seefta, iyo abaartaba ka caymatay, waxaan gelin doonaa
gacanta Nebukadresar oo ah boqorka Baabuloon, iyo
gacanta cadaawayaashooda, iyo gacanta kuwa naftooda
doondoonaya, oo isna seef buu ku layn doonaa, oo innaba
uma tudhi doono, umana nixi doono, umana naxariisan
doono. 8 Oo dadkanna waxaad ku tidhaahdaa, Rabbigu
wuxuu leeyahay, Bal ogaada, waxaan idin hor dhigayaa jidka
nolosha iyo jidka geerida. 9 Kii magaaladan sii joogaaba
wuxuu ku dhiman doonaa seef, iyo abaar, iyo belaayo,
laakiinse kii baxa oo reer Kaldayiinka idin hareeraynaya
u galaa wuu noolaan doonaa, oo naftiisu waxay isaga u
ahaan doontaa sida booli oo kale. 10 Waayo, Rabbigu wuxuu
leeyahay, Wejigaygaan magaaladan ugu jeediyey inaan
masiibo ku sameeyo ee ma aha wanaag. Waxay gacanta u
geli doontaa boqorka Baabuloon, oo isna dab buu ku gubi
doonaa. 11 Erayga Rabbiga ee ku saabsan reerka boqorka
dalka Yahuudah maqla. 12 Rabbigu wuxuu leeyahay, Reer
Daa'uudow, aroortii caddaalad sameeya, oo kii la dhacay
kii dulmay ka samatabbixiya, si ayan cadhadaydu u soo
bixin sidii dab oo kale, oo ayan u hurin si aan innaba loo
demin sharka falimihiinna aawadiis. 13 Rabbigu wuxuu
leeyahay, Ogaada, col baan idinla ahay, kuwiinna dooxada
iyo dhagaxa bannaanka deggan ee yidhaahda, Bal yaa nagu
soo dhaadhici kara, amase yaa rugtayada soo geli kara?
14 Rabbigu wuxuu leeyahay, Anigu waxaan idiin ciqaabi
doonaa siday midhaha falimihiinnu ahaayeen, oo dab baan
kaynta oo dhan ku dayn doonaa, oo wuxuu baabbi'in doonaa
waxyaalaha hareeraha ku yaal oo dhan.

22 Rabbigu wuxuu leeyahay, Waxaad u dhaadhacdaa
guriga boqorka dalka Yahuudah, oo halkaas eraygan
kaga hadal, 2 oo waxaad tidhaahdaa, Boqorka dalka
Yahuudah ee carshiga Daa'uud ku fadhiyow, bal erayga
Rabbiga maqal, adiga iyo addoommadaada iyo dadkaaga
irdahan soo galow, wada maqla. 3 Rabbigu wuxuu leeyahay,
Caddaalad iyo xaqnimo sameeya, oo kii la dhacay kii dulmay
ka samatabbixiya, oo ha dulminina, hana xumaynina, hana
wax yeelina qariibka, iyo agoonta, iyo carmalka toona,
oo meeshanna dhiig aan xaq qabin ha ku daadinina. 4
Waayo, sida xaqiiqada ah idinku haddaad waxyaalahan

samaysaan, markaas boqorro carshigii Daa'uud ku fadhiisan
doona ayaa irdaha gurigan soo geli doona, iyagoo fuushan
gaadhifardood iyo fardo, iyaga, iyo addoommadooda iyo
dadkooduba. 5 Laakiinse haddaad erayadan maqli weydaan,
Rabbigu wuxuu leeyahay, Nafsaddaydaan ku dhaartaye
guriganu cidluu noqon doonaa. 6 Waayo, Rabbigu wuxuu ku
leeyahay reerka boqorka Yahuudah, Adigu waxaad ii tahay
sida Gilecaad iyo sida Buur Lubnaan dhaladeeda oo kale,
laakiinse sida xaqiiqada ah waxaan kaa dhigi doonaa cidla,
iyo sida magaalooyin aan ciduna degganayn oo kale. 7
Oo waxaan kuu diyaarin doonaa kuwa ku baabbi'inaya oo
midkood kastaaba hubkiisii sito, oo geedahaaga la doortay
oo kedarka ah way jari doonaan, oo dab bay ku dhex tuuri
doonaan. 8 Oo quruumo badan baa magaaladan soo ag
mari doona, oo midkood kastaaba wuxuu deriskiisa ku odhan
doonaa, Rabbigu muxuu sidan magaaladan weyn ugu galay?
9 Oo iyana waxay ugu jawaabi doonaan, Maxaa yeelay,
axdigii Rabbiga Ilaahooda ah ayay ka tageen, oo waxay
caabudeen oo u adeegeen ilaahyo kale. 10 Kii dhintay ha
u ooyina, hana u barooranina, laakiinse waxaad aad ugu
ooydaan kii dhoofa, waayo, isagu mar dambe ma soo noqon
doono, oo dalkiisii hooyo ee uu ku dhashayna ma uu arki
doono. 11 Waayo, Rabbigu wuxuu ka leeyahay Shalluum ina
Yoosiyaah oo ahaa boqorkii Yahuudah, kaasoo boqor ka
noqday meeshii aabbihiis Yoosiyaah, oo meeshan ka baxay,
Isagu mar dambe halkan kuma soo noqon doono, 12 laakiinse
wuxuu ku dhiman doonaa meeshii ay isaga maxaabiis ahaan
ugu kaxaysteen, oo dalkan mar dambe ma uu arki doono.
13 Waxaa iska hoogay ninka gurigiisa xaqdarro ku dhistaa,
oo qolalkiisana caddaaladdarro ku dhista, oo intuu deriskiisa
adeegsado aan mushahaaro siin, oo aan shuqulkiisii waxba
u siin, 14 oo yidhaahda, Anigu waxaan dhisan doonaa
guri ballaadhan iyo qolal waaweyn, oo daaqado samaysta,
oo saqafkiisa hoose ka dhiga qoryo kedar ah, oo rinji
cas mariya. 15 Ma waxaad u malaynaysaa inaad boqor
tahay qoryo kedar ah oo aad ku loollamaysid aawadood?
Aabbahaa isagoo wax cunaya oo wax cabbaya miyuusan
caddaalad iyo xaqnimo samayn jirin? Oo markaas isagu sow
ma nabdoonayn? 16 Isagu miskiinka iyo saboolka baahan
buu u garsoori jiray, oo markaasuu nabdoonaa. Rabbigu
wuxuu leeyahay, In lay aqoonsado sow taasu ma aha? 17
Laakiinse indhahaaga iyo qalbigaagu waxay keliyahoo u
diyaar yihiin faa'iidadaada xaqdarrada ah, iyo inay dhiig
aan xaq qabin daadiyaan, iyo inay dulmi iyo waxyeelid
sameeyaan. 18 Sidaas daraaddeed Rabbigu wuxuu ka
leeyahay Yehooyaaqiim ina Yoosiyaah oo ah boqorka dalka
Yahuudah, Isaga looma barooran doono, iyagoo leh, Hoogay
walaalkayow, amase Hoogay walaashayay! Oo isaga looma
barooran doono iyagoo leh, Hoogay sayidow, amase Hoogay
isagu sharaf badnaaye! 19 Isaga waxaa loo xabaali doonaa
sida dameer loo xabaalo oo kale, oo inta la jiido ayaa irdaha
Yeruusaalem dibadda looga bixin doonaa. 20 Lubnaan u
kac oo halkaas ka qayli, oo Baashaan codkaaga kor ugu
qaad, oo Cabaariim ka qayli, waayo, kuwii ku jeclaa oo
dhan waa la wada baabbi'iyey. 21 Markaad barwaaqaysnayd
waan kula hadlay, laakiinse waxaad tidhi, Innaba ku maqli
maayo. Oo tan iyo yaraantaadiina sidaasaad ahayd, oo
codkaygana ma aadan addeecin. 22 Dabaysha ayaa wada
qaadi doonta daajiyayaashaada oo dhan, oo kuwa ku jecelna
maxaabiis ahaan baa loo wada kaxaysan doonaa. Sida
xaqiiqada ah markaas waad ceeboobi doontaa oo waxaad
ku sharafjabi doontaa sharnimadaadii aawadeed oo dhan.
23 Kuwiinna Lubnaan deggan oo geedaha kedarka ah buulka
ka samaystow, aad baad ugu taahi doontaan markii xanuun
idin qabto sida naag foolanaysa oo kale! 24 Rabbigu wuxuu
leeyahay, Noloshaydaan ku dhaartaye, xataa haddii Konyaah
ina Yehooyaaqiim oo ah boqorka dalka Yahuudah uu ahaan
lahaa katuunka gacantayda midig, xataa markaas waan
kaa rujin lahaa meeshan. 25 Oo waxaan kuu gelin doonaa
gacanta kuwa naftaada doondoonaya, iyo gacanta kuwa aad
ka baqaysid, oo ah Nebukadresar oo boqorka Baabuloon
ah, iyo reer Kaldayiin. 26 Oo adiga iyo hooyadaadii ku
dhashayba waxaan ku dhex xoori doonaa dal aydaan ku
dhalan, oo halkaasaad ku dhiman doontaan. 27 Laakiinse
dalka ay u xiisoonayaan inay ku noqdaan, halkaas innaba
kuma ay soo noqon doonaan. 28 Ninkan Konyaah ahu ma
dheri jabay oo la nacay baa? Ma weel aan la doonayn
baa? Bal maxaa isaga iyo farcankiisiiba loo tuuray, oo
maxaa loogu dhex xooray dal ayan innaba aqoonin? 29
Dhulkow, dhulkow, dhulkow, bal erayga Rabbiga maqal. 30
Rabbigu wuxuu leeyahay, Waxaad ninkan ku qortaan sidii
madhalays oo kale iyo nin aan cimrigiis liibaanayn, waayo,
isaga farcankiisa ninna ka liibaani maayo inuu carshigii
Daa'uud ku dul fadhiisto, oo uu dalka Yahuudah mar dambe
ka dhex taliyo.

**23** Rabbigu wuxuu leeyahay, Waxaa iska hoogay
adhijirrada idihii daaqsintayda baabbi'iya oo kala
firdhiya! 2 Sidaas daraaddeed Rabbiga ah Ilaaha reer binu
Israa'iil wuxuu ka leeyahay adhijirrada dadkayga daajiya,
Adhigaygii waad kala firdhiseen, waadna kala erideen, oo
soomana aydnaan ilaalin. Bal eega, waxaan idiin ciqaabi
doonaa sharkii falimihiinna, ayaa Rabbigu leeyahay. 3 Oo intii
adhigayga ka hadhayna waxaan ka soo wada ururin doonaa

waddammadii aan u kexeeyey oo dhan, waanan ku soo
celin doonaa xeryahoodii, oo wax badan way dhali doonaan,
wayna tarmi doonaan. 4 Oo waxaan iyaga u yeeli doonaa
adhijirro daajiya, oo mar dambe ma ay baqi doonaan, mana
ay nixi doonaan, oo innaba midna kama dhimmanaan doono.
5 Rabbigu wuxuu leeyahay, Bal eega, waxaa soo socda
wakhti aan Daa'uud u kicin doono biqil xaq ah, oo boqor ayuu
ahaan doonaa, wuuna liibaani doonaa, oo wuxuu dhulka ku
samayn doonaa caddaalad iyo xaqnimo. 6 Oo wakhtigiisa
dadka Yahuudah way badbaadi doonaan, oo dadka Israa'iilna
ammaan bay ku degganaan doonaan, oo magiciisa lagu
magacaabi doonona waa Rabbiga Xaqnimadayada ah. 7
Sidaas daraaddeed Rabbigu wuxuu leeyahay, Bal ogaada,
waxaa soo socda wakhti aan mar dambe la odhan doonin,
Waxaa nool Rabbigii reer binu Israa'iil dalkii Masar ka soo
bixiyey. 8 Laakiinse waxaa la odhan doonaa, Waxaa nool
Rabbigii farcankii reer binu Israa'iil ka soo bixiyey oo ka soo
hor kacay dalkii woqooyi, iyo dalalkii uu u kexeeyey oo dhan,
oo iyana waxay degganaan doonaan dalkooda. 9 Qalbigaygii
uurkayguu ku qarracmay waana nebiyada daraaddood,
lafahayga oo dhammu way wada ruxmadaan, oo waxaan
la mid ahay nin sakhraan ah oo khamri ka adkaaday,
waana Rabbiga iyo erayadiisa quduuska ah daraaddood.
10 Dalka waxaa ka buuxa dhillayo, oo habaar daraaddiis
ayaa dalkii la barooranayaa. Daaqsimihii duurku way wada
engegeen. Socodkoodu waa shar oo xooggooduna ma
qummana. 11 Waayo, Rabbigu wuxuu leeyahay, Nebigii iyo
wadaadkiiba nijaas bay wada yihiin, oo gurigayga ayaan
xumaantoodii ka helay. 12 Sidaas daraaddeed jidkoodu
wuxuu u noqon doonaa sida meelo sibiibix ah oo gudcur ku
dhex yaal. Iyaga waa lagu sii kaxayn doonaa oo halkaasay
ku dhici doonaan, waayo, sannadda ciqaabiddooda masiibo
baan ku soo dayn doonaa, ayaa Rabbigu leeyahay. 13 Oo
nebiyada Samaariyana nacasnimaan ku arkay. Waxay wax
ku sii sheegeen Bacal magiciisa, oo dadkaygii reer binu
Israa'iilna way qaldeen. 14 Oo nebiyadii Yeruusaalemna
wax aad iyo aad u xun, baan ku arkay. Way sinaystaan,
oo been bay ku socdaan, oo weliba waxay sii xoogeeyaan
gacmaha xumaanfalayaasha, si aan midnaba xumaantiisa
uga soo noqon. Iyagu kulligood waxay iila mid noqdeen
sidii Sodom, oo kuwii degganaana sidii Gomora oo kale. 15
Sidaas daraaddeed Rabbiga ciidammadu wuxuu nebiyada
ka leeyahay, Bal ogaada, waxaan iyaga ku quudin doonaa
dacar, oo waxaan cabsiin doonaa biyo xammeetiyeed,
waayo, nijaas baa nebiyada Yeruusaalem ka soo faaftay
oo waxay wada gaadhay dalka oo dhan. 16 Rabbiga
ciidammadu wuxuu leeyahay, Nebiyada wax idiin sii sheega
hadalkooda ha maqlina, waayo, wax aan waxba ahayn
way idin baraan, oo waxay ku hadlaan riyo qalbigooda ka
timid oo aan afka Rabbiga ka soo bixin. 17 Oo waxay had
iyo goorba kuwa i quudhsada ku yidhaahdaan, Rabbigu
wuxuu yidhi, Nabad baad helaysaan. Oo waxay mid kasta
oo caasinimada qalbigiisa daba galana ku yidhaahdaan,
Wax masiibo ahu innaba kugu dhici maayaan. 18 Waayo,
bal yaa guddiga Rabbiga dhex istaagay inuu garto oo maqlo
eraygiisa? Yaase eraygiisa dhegta u dhigay oo soo maqlay?
19 Bal eega, duufaankii Rabbiga ayaa soo baxay, kaasoo ah
cadhadiis, waana dabayl cirwareen ah, oo waxay ku dhici
doontaa madaxa sharrowyada. 20 Rabbiga xanaaqiisu dib
u noqon maayo jeeruu sameeyo oo wada oofiyo qasdiga
qalbigiisa, oo ugudambaystana aad baad u garan doontaan.
21 Anigu nebiyadaas sooma aan dirin, laakiinse way ordeen
oo iyaga lama aan hadlin, laakiinse wax bay sii sheegeen.
22 Haddii ay guddigayga dhex istaageen, de markaas
dadkaygay erayadayda maqashiin lahaayeen, oo waxay
iyaga ka soo celin lahaayeen jidkooda xun iyo sharka
falimahoodaba. 23 Rabbigu wuxuu leeyahay, Anigu ma
waxaan ahay Ilaah dhow, oo miyaanan ahayn Ilaah fog? 24
Rabbigu wuxuu leeyahay, Miyaa cidi isku qarin kartaa meelo
qarsoon oo aanan ka arki karin? Waxaa kaluu Rabbigu
leeyahay, Anigu sow kama buuxo cirka iyo dhulkaba? 25
Waan maqlay wixii ay yidhaahdeen nebiyada magacayga
beenta ku sii sheega oo yidhaahda, Waan riyooday, waan
riyooday. 26 Ilaa goormay waxanu ku sii jirayaan qalbiga
nebiyada beenta sii sheega? Iyagu waa nebiyo sii sheega
khiyaanada qalbigooda. 27 Waxay u malaynayaan inay
dadkayga magacayga ku illowsiiyaan riyooyinkooda midkood
kastaba uu deriskiisa u sheego, sidii awowayaashoodba
ay magacayga ugu illoobeen Bacal aawadiis. 28 Rabbigu
wuxuu leeyahay, Nebigii riyo arkay, riyadiisa ha sheego,
oo kii eraygayga maqlayna si daacad ah eraygayga ha
u sheego. Buunshaha iyo sarreenka bal maxaa u kala
dhexeeya? 29 Rabbigu wuxuu leeyahay, Miyaan eraygaygu
ahayn sida dab oo kale, iyo sida dubbe dhagaxa kala
burburiya oo kale? 30 Sidaas daraaddeed Rabbigu wuxuu
leeyahay, Bal ogaada, anigu waxaan col ku ahay nebiyada
midkood kastaba erayadayda ka xada deriskiisa. 31 Rabbigu
wuxuu leeyahay, Bal ogaada, col baan ku ahay nebiyada
carrabkooda ku isticmaala oo yidhaahda, Saasuu Rabbigu
leeyahay. 32 Rabbigu wuxuu leeyahay, Bal ogaada, col baan
ku ahay kuwa wax ku sii sheega riyooyin been ah, oo intay u
warramaan dadkayga ku qalda beentooda iyo faankooda aan
waxtarka lahayn. Rabbigu waxaa kaluu leeyahay, Anigu iyaga
ma soo dirin, oo innaba mana amrin, oo iyagu dadkan waxba

kuma tari doonaan. 33 Oo markii dadkan ama nebi ama
wadaad uu ku weyddiiyo, oo uu kugu yidhaahdo, Rabbiga
warkiisa culus waa maxay? Waxaad iyaga ku tidhaahdaa,
Waa war maxay ah? Waan idin xoorayaa, ayaa Rabbigu
leeyahay. 34 Oo weliba nebigii iyo wadaadkii iyo dadkii
odhan doona, Waa kan warka culus ee Rabbiga, ninkaas iyo
reerkiisaba waan ciqaabi doonaa. 35 Midkiin kastaaba wuxuu
deriskiisa ku odhan doonaa, oo midkiin kastaaba wuxuu
walaalkiis ku odhan doonaa, Muxuu Rabbigu ku jawaabay?
Oo muxuu Rabbigu ku hadlay? 36 Oo Rabbiga warkiisa
culusna mar dambe kama aad hadli doontaan, waayo,
nin walba eraygiisaa war culus u noqon doona, maxaa
yeelay, idinku waxaad qalloociseen erayadii Ilaaha nool oo
ah Rabbiga ciidammada oo ah Ilaahayaga. 37 Waxaad
nebiga ku tidhaahdaa, Muxuu Rabbigu kuugu jawaabay?
Oo muxuu Rabbigu ku hadlay? 38 Laakiinse haddaad
tidhaahdaan, Waa warka culus ee Rabbiga, Rabbigu wuxuu
idinku leeyahay, Idinku waxaad tidhaahdaan erayadan oo ah,
Waa warka culus ee Rabbiga, oo sidaas daraaddeed baan
idiinku soo cid diray anigoo idinku leh, Waa inaadan odhan,
Waa warka culus ee Rabbiga. 39 Sidaas daraaddeed bal
ogaada, Aniga qudhayda ayaa giddigiin idin illoobi doona,
waanan idin xoori doonaa idinka iyo magaaladii aan idinka
iyo awowayaashiinba siiyey, oo hortaydana waan idinka
fogayn doonaa. 40 Oo waxaan idinku soo dejin doonaa cay
aan weligeed idinka hadhayn, iyo ceeb had iyo goorba idinku
dul waaraysa, oo aan marnaba la illoobayn.

**24** Markii Nebukadresar oo ahaa boqorkii Baabuloon
uu maxaabiis ahaan u kaxaystay Yekonyaah ina
Yehooyaaqiim oo ahaa boqorkii dalka Yahuudah, iyo amiirradii
dadka Yahuudah, iyo saanacyadii, iyo birtumayaashiiba
oo uu ka kaxaystay Yeruusaalem oo Baabuloon geeyey
dabadeed Rabbigu wax buu i tusay, oo waxaan arkay laba
dambiilood oo berde ah oo macbudka Rabbiga hor yaal. 2 Oo
dambiilaha midkood waxaa ku jiray berde aad u wanaagsan,
oo la moodo sidii midho berde oo hore u bislaaday, oo
dambiisha kalena waxaa ku jiray midho berde oo aad u xun,
oo xumaantooda aawadeedna aan innaba la cuni karin. 3
Markaas Rabbigu wuxuu igu yidhi, Yeremyaahow, maxaad
aragtaa? Oo aniguna waxaan idhi, Waxaan arkaa midho
berde. Midhaha berde oo wanaagsan aad bay u wanaagsan
yihiin, kuwa xumuna aad bay u xun yihiin, oo xumaantooda
aawadeed innaba lama cuni karo. 4 Markaas waxaa ii yimid
Eraygii Rabbiga oo leh, 5 Rabbiga ah Ilaaha reer binu Israa'iil
wuxuu leeyahay, Sida midhahaas berde oo wanaagsan
ayaan wanaag aawadiis u aqoonsan doonaa maxaabiista
dadka Yahuudah oo aan meeshan ka diray, oo aan dalka
reer Kaldayiin u geeyey. 6 Waayo, waxaan indhahayga
iyaga ugu hayn doonaa wanaag aawadiis, oo dalkan baan
ku soo celin doonaa, waanan dhisi doonaa, oo innaba ma
aan dumin doono, waanan beeri doonaa, oo innaba ma
aan rujin doono. 7 Oo waxaan iyaga siin doonaa qalbi ay
igu gartaan, si ay u ogaadaan inaan anigu Rabbiga ahay,
oo waxay noqon doonaan dadkaygii, anna waxaan noqon
doonaa Ilaahoodii, waayo, qalbigooda oo dhan way iigu
soo noqon doonaan. 8 Rabbigu wuxuu leeyahay, Midhaha
berde oo xun oo xumaantooda aawadeed aan innaba la cuni
karin, hubaal sidaas oo kalaan u xoori doonaa Sidqiyaah
oo ah boqorka dalka Yahuudah, iyo amiirradiisa, iyo kuwa
reer Yeruusaalem ah oo dalkan ku dhex hadhay, iyo kuwa
dalka Masar degganba. 9 Oo waxaan ka dhigi doonaa
inay boqortooyooyinka dunida oo dhan hor iyo dib ku dhex
rogrogmadaan, oo meelaha aan iyaga u kaxayn doono
oo dhanba waxay ku noqon doonaan cay iyo maahmaah
iyo halqabsi iyo habaar. 10 Oo waxaan dhexdooda ku soo
dayn doonaa seef, iyo abaar, iyo belaayo, ilaa ay ka wada
baabba'aan dalkii aan siiyey iyaga iyo awowayaashoodba.

**25** Kanu waa eraygii Yeremyaah u yimid oo ku
saabsanaa dadka Yahuudah oo dhan, waxayna
ahayd Yehooyaaqiim ina Yoosiyaah oo ahaa boqorkii dalka
Yahuudah sannaddiisii afraad, taasoo ahayd sannaddii
kowaad oo Nebukadresar oo ahaa boqorkii Baabuloon. 2
Eraygaas Nebi Yeremyaah ayaa kula hadlay dadkii Yahuudah
oo dhan iyo kuwii Yeruusaalem degganaa oo dhan, oo
wuxuu ku yidhi, 3 Tan iyo sannaddii saddex iyo tobnaad oo
Yoosiyaah ina Aamoon uu boqor ka ahaa dalka Yahuudah
iyo ilaa maantadan la joogo, taasoo ah saddex iyo labaatan
sannadood, waxaa ii imanayay Eraygii Rabbiga, oo aniguna
waan idinla hadlay, anoo goor wanaagsan idinla hadlaya,
laakiinse idinku innaba ma aydaan dhegaysan. 4 Oo
Rabbiguna wuxuu idiin soo diray addoommadiisii nebiyada
ahaa oo dhan, isagoo goor wanaagsan diraya, laakiinse
idinku innaba ma aydaan dhegaysan, oo marnaba dheg uma
aydaan dhigin inaad maqashaan. 5 Oo waxay yidhaahdeen,
Midkiin kastaaba haatan jidkiisa ha ka soo noqdo, oo sharka
falimihiinnana ka noqda, oo waxaad iska dhex degganaataan
dalkii Rabbigu idinka iyo awowayaashiinba weligiin iyo
weligiinba idin siiyey. 6 Oo ilaahyo kale ha u daba gelina inaad
u adeegtaan oo caabuddaan, oo shuqullada gacmihiinna ha
igaga cadhaysiinina, oo aniguna innaba wax idin yeeli maayo.
7 Laakiinse ima aydaan dhegaysan, ayaa Rabbigu leeyahay,
si aad shuqullada gacmihiinna igaga cadhaysiisaan, oo ay

waxyeello idiin soo gaadho. 8 Sidaas daraaddeed Rabbiga
ciidammadu wuxuu leeyahay, Erayadaydii waad dhegaysan
weydeen, oo sidaas daraaddeed, Rabbigu wuxuu leeyahay,
9 Bal ogaada, waxaan soo diri doonaa qolooyinka reer
woqooyi oo dhan, iyo addoonkayga ah Nebukadresar oo
ah boqorka Baabuloon, oo iyagaan ku soo kicin doonaa
dalkan, iyo dadka deggan, iyo quruumaha ku wareegsan
oo dhan, oo kulligoodna waan wada baabbi'in doonaa,
oo waxaan ka dhigi doonaa wax laga yaabo oo loogu
foodhyo, iyo cidla weligeed ah. 10 Oo weliba waxaan iyaga
ka baabbi'in doonaa codka rayraynta, iyo codka farxadda,
iyo codka arooska, iyo codka aroosadda, iyo sanqadha
dhagaxshiidka, iyo iftiinka laambadda. 11 Oo dalkan oo
dhammuna wuxuu noqon doonaa cidla iyo wax laga yaabo,
oo quruumahanuna toddobaatan sannadood ayay boqorka
Baabuloon u adeegi doonaan. 12 Oo markay toddobaatanka
sannadood dhammaadaan ayaan xumaantooda aawadeed
u ciqaabi doonaa boqorka Baabuloon iyo quruuntaas,
iyo dalka reer Kaldayiinba, oo waxaan ka dhigi doonaa
meelo weligoodba cidla ah. 13 Oo waxaan dalkaas ku
soo dayn doonaa erayadaydii aan kaga hadlay oo dhan,
kuwaasoo ah waxa kitaabkan ku qoran oo dhan, oo ah
wixii Yeremyaah quruumaha oo dhan ka sii sheegay. 14
Waayo, iyagaba waxaa addoonsan doona quruumo badan
iyo boqorro waaweyn, oo waxaan iyaga u abaalmarin
doonaa siday falimahoodu ahaayeen, iyo siday shuqullada
gacmahoodu ahaayeen. 15 Waayo, Rabbiga ah Ilaaha reer
binu Israa'iil wuxuu igu leeyahay, Cadhadan koobkeeda
khamriga gacantayda ka qaad, oo waxaad wada cabsiisaa
quruumaha aan kuu dirayo oo dhan. 16 Oo iyana way cabbi
doonaan, oo way iska dhacdhici doonaan, wayna la waalan
doonaan seefta aan dhexdooda u soo dirayo daraaddeed. 17
Markaasaan koobkii gacantii Rabbiga ka qaaday, oo waxaan
cabsiiyey quruumihii Rabbigu ii diray oo dhan, kuwaas oo
ahaa 18 Yeruusaalem, iyo magaalooyinka dalka Yahuudah,
iyo boqorradooda, iyo amiirradooda, si aan iyaga uga dhigo
cidla, iyo wax laga yaabo oo lagu foodhyo, iyo inkaar, siday
maantaba tahay, 19 iyo Fircoon oo ah boqorka Masar, iyo
addoommadiisa, iyo amiirradiisa, iyo dadkiisa oo dhan, 20
iyo dadka isku qasan oo dhan, iyo boqorrada dalka Cuus
oo dhan, iyo boqorrada dalka reer Falastiin oo dhan, iyo
Ashqeloon, iyo Gaasa, iyo Ceqroon, iyo kuwa Ashdood ka
hadhay, 21 iyo Edom, iyo Moo'aab, iyo reer Cammoon, 22
iyo boqorrada Turos oo dhan, iyo boqorrada Siidoon oo
dhan, iyo boqorrada gasiiradaha badda ka shisheeya, 23 iyo
Dedaan, iyo Teemaa, iyo Buus, iyo inta timaha dhinacyada
ka jarata oo dhan, 24 iyo boqorrada Carabiya oo dhan,
iyo boqorrada dadka isku qasan oo lamadegaanka dhex
deggan oo dhan, 25 iyo boqorrada Simrii oo dhan, iyo
boqorrada Ceelaam oo dhan, iyo boqorrada reer Maaday
oo dhan, 26 iyo boqorrada woqooyi oo dhan, ku fog iyo
ku dhowba, kan iyo kaasba, iyo boqortooyooyinka dunida
ee dhulka joogo oo dhan, oo iyaga dabadoodna waxaa
cabbi doona boqorka Sheeshag. 27 Oo waxaad iyaga ku
tidhaahdaa, Rabbiga ciidammada oo ah Ilaaha reer binu
Israa'iil wuxuu idinku leeyahay, Cabba oo sakhraama, oo
mantaga, oo dhaca, oo innaba mar dambe ha soo sara
kicina, seefta aan dhexdiinna u soo diri doono daraaddeed.
28 Oo hadday diidaan inay koobka gacantaada ka qaataan oo
ay cabbaan, markaas waxaad iyaga ku tidhaahdaa, Rabbiga
ciidammadu wuxuu idinku leeyahay, Hubaal waad cabbi
doontaan! 29 Waayo, Rabbiga ciidammadu wuxuu leeyahay,
Bal eega, waxaan bilaabayaa inaan masiibo ku soo dejiyo
magaaladii laygu magacaabay, haddaba miyaan idinkana
laydin wada ciqaabayn? Idinku ciqaabla'aan ku sii joogi
maysaan, waayo, waxaan u yeedhayaa seef inay ku dhacdo
dadka dhulka deggan oo dhan. 30 Sidaas daraaddeed
erayadan oo dhan iyaga kaga sii hadal, oo waxaad ku
tidhaahdaa, Rabbigu xagga saruu ka qaylin doonaa, oo
codkiisuu kaga soo hadli doonaa hoygiisa quduuska ah, oo
wuxuu si weyn ugu qaylin doonaa xeradiisa, oo dadka dhulka
deggan oo dhanna wuxuu ugu qaylin doonaa sida kuwa
canabka ku tunta. 31 Rabbigu wuxuu leeyahay, Dhawaaq
baa gaadhi doona tan iyo dhulka darafkiisa, maxaa yeelay,
Rabbigu dacwad buu la leeyahay quruumaha, oo wuxuu la
muddacayaa binu-aadmiga oo dhan, oo kuwa sharka ahna
seef buu u gacangelin doonaa. 32 Rabbiga ciidammadu
wuxuu leeyahay, Bal ogaada, masiibaa soo bixi doonta oo
quruun bay quruun kale uga sii gudbi doontaa, oo duufaan
weyn ayaa laga soo kicin doonaa dhulka darafyadiisa. 33
Oo kuwa Rabbigu laaya waxay maalintaas oolli doonaan
dhulka darafkiisan iyo darafkiisa kale inta ka dhex leh. Oo
iyaga looma barooran doono, lamana soo ururin doono,
lamana xabaali doono, oo waxay noqon doonaan sida digo
dhulka ku kor daadsan. 34 Adhijirradow, ooya oo qayliya;
kuwa adhiga madaxda u ahow, dambas ku galgasha, waayo,
wakhtigii laydin gowraci lahaa waa yimid. Waan idin burburin
doonaa, oo waxaad u dhici doontaan sida weel wanaagsan
oo kale. 35 Oo adhijirradu meel ay ku cararaan ma ay heli
doonaan, oo adhiga madaxdiisuna meel ay ku baxsadaan
ma ay heli doonaan. 36 Oo waxaa la maqli doonaa codkii
qaylada adhijirrada, iyo cidii adhiga madaxdiisa, waayo,
Rabbigu wuxuu kala baabbi'iyey daaqsintoodii. 37 Oo xeryihii
nabaadiinada waa la wada baabbi'iyey Rabbiga xanaaqiisa

kulul aawadiis. 38 Wuxuu meeshiisii qarsoonayd uga soo
baxay sidii libaax oo kale, waayo, dalkoodii cidla buu noqday,
waana baabbi'iyaha cadhadiisa aawadeed iyo xanaaqiisa
kulul aawadiis.

26 Bilowgii boqornimadii Yehooyaaqiim ina Yoosiyaah
oo boqor ka ahaa dalka Yahuudah ayaa erayganu
xagga Rabbiga ka yimid, isagoo leh, 2 Rabbigu wuxuu
leeyahay, Waxaad istaagtaa guriga Rabbiga barxaddiisa,
oo dadka magaalooyinka dalka Yahuudah oo u yimid inay
Rabbiga gurigiisa ku caabudaan oo dhan la hadal, oo
erayada aan kugu amro inaad kula hadashid erayna ha
ka reebin. 3 Mindhaa waxaa suurtowda inay ku maqlaan
oo mid kastaaba ka soo noqdo jidkiisa sharka ah, inaan
anigu ka soo noqdo masiibadii aan u qasdiyey inaan iyaga
ku sameeyo sharka falimahooda aawadiis. 4 Oo waxaad
iyaga ku tidhaahdaa, Rabbigu wuxuu leeyahay, Haddaad
i maqli weydaan si aad ugu socotaan sharcigayga aan
idin hor dhigay, 5 oo aad u maqashaan erayada nebiyada
addoommadayda ah oo aan idiin soo diro, anigoo goor
wanaagsan idiin soo diraya, laakiin innaba ma aydaan
dhegaysan, 6 markaas gurigan waxaan ka dhigi doonaa
sida Shiiloh oo kale, oo magaaladanna quruumaha dunida
oo dhan ayaan habaar uga dhigi doonaa. 7 Oo wadaaddadii
iyo nebiyadii iyo dadkii oo dhammuba waxay maqleen
Yeremyaah oo erayadan gurigii Rabbiga kagaga dhex
hadlaya, 8 oo markii Yeremyaah uu wada dhammeeyey
hadalkii uu Rabbigu ku amray inuu dadka oo dhan kula hadlo
ayaa wadaaddadii, iyo nebiyadii, iyo dadkii oo dhammu
isagii qabteen, oo waxay ku yidhaahdeen, Hubaal waa inaad
dhimataa! 9 Bal maxaad magaca Rabbiga wax ugu sii
sheegtay adigoo leh, Guriganu wuxuu noqon doonaa sidii
Shiiloh oo kale, oo magaaladanuna waxay noqon doontaa
cidla oo aan ciduna degganayn? Oo dadkii oo dhammuna
Yeremyaah ayay gurigii Rabbiga ugu soo wada urureen.
10 Oo amiirradii dalka Yahuudahna markay waxyaalahaas
maqleen ayay gurigii boqorka ka soo bexeen oo waxay
yimaadeen gurigii Rabbiga, wayna fadhiisteen meesha laga
soo galo iridda cusub ee guriga Rabbiga. 11 Markaasaa
wadaaddadii iyo nebiyadii la hadleen amiirradii iyo dadkii oo
dhan, oo waxay yidhaahdeen, Ninkanu dhimashuu istaahilaa,
waayo, magaaladan ayuu wax ka sii sheegay sidii idinkuba
aad dhegihiinna ku maqasheen. 12 Markaas Yeremyaah
wuxuu la hadlay amiirradii oo dhan iyo dadkii oo dhan, oo
wuxuu ku yidhi, Rabbiga ayaa ii soo diray inaan gurigan iyo
magaaladanba ka sii sheego erayadii aad maqasheen oo
dhan. 13 Haddaba jidadkiinna iyo falimihiinnaba hagaajiya,
oo codka Rabbiga Ilaahiinna ah addeeca, oo Rabbiguna
wuu ka soo noqon doonaa masiibadii uu idinkaga hadlay.
14 Bal eega, anigu gacmihiinnaan ku jiraa, haddaba iigu
sameeya sida idinla wanaagsan oo idinla qumman. 15
Laakiinse bal si xaqiiq ah u ogaada, haddaad i dishaan,
waxaad nafsaddiinna iyo magaaladan iyo dadka degganba
u soo jiidaysaan dhiig aan xaq qabin, waayo, sida runta
ah Rabbiga ayaa ii soo diray xaggiinna inaan dhegihiinna
oo dhan erayadan maqashiiyo. 16 Markaasaa amiirradii
iyo dadkii oo dhammu waxay wadaaddadii iyo nebiyadii ku
yidhaahdeen, Ninkanu dhimasho ma istaahilo, waayo, wuxuu
nagula hadlay magicii Rabbiga Ilaaheenna ah. 17 Markaas
waxaa istaagay qaar ka mid ah waayeelladii dalka oo waxay
la hadleen shirkii dadka oo dhan, iyagoo leh, 18 Miikaah kii
reer Mooreshed ayaa wax sii sheegay wakhtigii Xisqiyaah uu
boqorka ka ahaa dalka Yahuudah, oo dadka Yahuudah oo
dhan ayuu la hadlay, oo wuxuu yidhi, Rabbiga ciidammadu
wuxuu leeyahay, Siyoon waxaa loo jeexi doonaa sida beer
oo kale, oo Yeruusaalemna waxay noqon doontaa taallooyin
burbur ah, oo buurta guriguna waxay noqon doontaa sidii
meelaha sarsare ee kaynta ku yaal oo kale. 19 Haddaba
Xisqiyaah oo ahaa boqorkii dalka Yahuudah, iyo dadka
Yahuudah oo dhammu miyey isagii dileen? Oo miyuusan
isagu Rabbiga ka cabsan, oo uusan Rabbiga baryin, oo
Rabbiguna miyuusan ka soo noqon masiibadii uu iyaga
kaga hadlay? Innagu masiibo weyn ayaynu nafteenna u
soo jiidi lahayn haddaan isaga dilno. 20 Oo weliba waxaa
kaloo jiray nin magaca Rabbiga wax ku sii sheegay, waana
Uuriyaah ina Shemacyaah oo ahaa reer Qiryad Yecaariim,
oo isna wuxuu magaaladan iyo dalkanba ka sii sheegay wax
erayada Yeremyaah oo dhan waafaqsan. 21 Oo markii Boqor
Yehooyaaqiim, iyo raggiisii xoogga badnaa oo dhan, iyo
amiirradii oo dhammu ay erayadiisii maqleen ayaa boqorkii
damcay inuu isaga dilo, laakiinse Uuriyaah markuu xaalkaas
maqlay ayuu baqay, oo intuu cararay ayuu dalkii Masar
tegey. 22 Markaasaa Boqor Yehooyaaqiim rag u diray dalkii
Masar, waxayna ahaayeen Elnaataan ina Cakboor iyo rag
kale oo isaga dalkii Masar u raacay. 23 Oo iyana dalkii
Masar ayay Uuriyaah ka soo bixiyeen, oo waxay u keeneen
Boqor Yehooyaaqiim, oo isna seef buu isagii ku dilay, oo
meydkiisiina wuu ku dhex tuuray qabuuraha dadka. 24
Habase ahaatee Axiiqaam ina Shaafaan gacantiisu way la
jirtay Yeremyaah inayan isaga ku ridin dadka gacantiisa si
ay u dilaan.

27 Bilowgii boqornimadii Yehooyaaqiim ina Yoosiyaah
oo boqor ka ahaa dalka Yahuudah ayaa erayganu

Yeremyaah xagga Rabbiga uga yimid, isagoo leh, 2 Rabbigu
wuxuu igu leeyahay, Waxaad samaysataa xadhko iyo
harqood, oo waxaad kor saartaa qoortaada. 3 Oo waxaad
iyaga ugu sii dhiibtaa boqorka dalka Edom, iyo boqorka dalka
Moo'aab, iyo boqorka reer Cammoon, iyo boqorka Turos, iyo
boqorka Siidoon gacanta wargeeyayaasha Yeruusaalem ugu
yimid boqorka dalka Yahuudah oo Sidqiyaah ah. 4 Oo waxaad
iyaga ku amartaa inay sayidyadooda ku yidhaahdaan,
Rabbiga ciidammada oo ah Ilaaha reer binu Israa'iil wuxuu
leeyahay, Waxaad sayidyadiinna ku tidhaahdaan, 5 Anigu
dhulka, iyo dadka iyo xayawaanka dhulka joogaba waxaan
ku sameeyey xooggayga weyn iyo gacantayda fidsan, oo
waxaan siiyaa kii ila qumman. 6 Oo haatan dalalkan oo dhan
waxaan siiyey addoonkayga Nebukadnesar oo ah boqorka
Baabuloon, oo weliba xayawaanka duurkana isagaan siiyey
inay u adeegaan. 7 Oo quruumaha oo dhammuna way u
wada adeegi doonaan isaga, iyo wiilkiisa, iyo wiilka wiilkiisa,
ilaa wakhtiga dalkiisu yimaado, oo dabadeedna quruumo
badan iyo boqorro waaweyn ayaa isaga addoonsan doona.
8 Oo Rabbigu wuxuu leeyahay, Quruuntii iyo boqortooyadii
aan u adeegin Nebukadnesar oo ah boqorka Baabuloon, oo
diida inay qoortooda ka hoos mariyaan harqoodka boqorka
Baabuloon, quruuntaas waxaan ku ciqaabi doonaa seef iyo
abaar iyo belaayo, ilaa aan iyaga gacantiisa ku baabbi'iyo.
9 Haddaba idinku innaba ha maqlina nebiyadiinna iyo
waxsheegyadiinna, iyo riyolowyadiinna, iyo faaliyayaashiinna
amase xataa saaxiriintiinna ee idinku yidhaahda, Idinku uma
aad adeegi doontaan boqorka Baabuloon, 10 waayo, been
bay idiinku sii sheegaan, si ay dalkiinna idinkaga fogeeyaan,
oo aan anigu dibadda idinku kexeeyo, oo aad u halligantaan
aawadeed. 11 Laakiinse Rabbigu wuxuu leeyahay, Quruuntii
qoorteeda ka hoos marisa harqoodka boqorka Baabuloon
inay isaga u adeegto aawadeed, taas dalkeedaan ku
dayn doonaa, oo beeraheeday sii fali doontaa, wayna sii
degganaan doontaa. 12 Weliba erayadan oo dhanna waan
kula hadlay Sidqiyaah oo ah boqorka dalka Yahuudah,
oo waxaan ku idhi, Qoortiinna ka hoos mariya harqoodka
boqorka Baabuloon, oo u adeega isaga iyo dadkiisa, oo saas
ku noolaada. 13 Oo bal maxaad adiga iyo dadkaaguba seefta
iyo abaarta iyo belaayada ugu dhimanaysaan, sida Rabbigu
uga hadlay quruuntii aan u adeegin boqorka Baabuloon?
14 Innaba ha maqlina nebiyada idinka hadla ee leh, Uma
aad adeegi doontaan boqorka Baabuloon, waayo, iyagu
been bay idiin sii sheegaan. 15 Maxaa yeelay, Rabbigu
wuxuu leeyahay, Anigu sooma aan dirin, laakiinse been bay
magacayga ku sii sheegaan, si aan idiin eryo, oo aad u
halligantaan, idinka iyo nebiyada wax idiin sii sheegaba.
16 Oo weliba wadaaddada iyo dadkan oo dhanba, waan la
hadlay oo waxaan ku idhi, Rabbigu wuxuu leeyahay, Innaba
ha maqlina erayadii nebiyadiinna wax idiin sii sheega, oo
idinku yidhaahda, Bal ogaada, weelashii guriga Rabbiga
mar dhow baa Baabuloon laga soo celin doonaa, waayo,
iyagu been bay idiin sii sheegaan. 17 Iyaga ha maqlina.
Boqorka Baabuloon u adeega, oo saas ku noolaada, waayo,
bal maxay magaaladani cidla u noqonaysaa? 18 Laakiinse
iyagu hadday nebiyo yihiin, iyo haddii eraygii Rabbigu uu
iyaga la jiro, haatan Rabbiga ciidammada ha ka baryeen in
weelasha ku hadhay guriga Rabbiga, iyo guriga boqorka
dalka Yahuudah, iyo Yeruusaalem gudaheeduba ayan
Baabuloon tegin. 19 Waayo, Rabbiga ciidammadu wuxuu ka
leeyahay tiirarka, iyo berkedda, iyo saldhigyada, iyo weelasha
magaaladan ku hadhay, 20 oo uusan Nebukadnesar oo ah
boqorka Baabuloon qaadan markuu maxaabiis ahaanta u
kaxaystay boqorkii dalka Yahuudah oo ahaa Yekonyaah
ina Yehooyaaqiim iyo saraakiishii dadka Yahuudah iyo reer
Yeruusaalemba, oo intuu Yeruusaalem ka kaxaystay uu
Baabuloon la tegey, 21 Rabbiga ciidammada oo ah Ilaaha
reer binu Israa'iil wuxuu ka leeyahay weelasha ku hadhay
guriga Rabbiga iyo guriga boqorka dalka Yahuudah, iyo
Yeruusaalemba, 22 Rabbigu wuxuu leeyahay, Iyaga waxaa
loo qaadan doonaa Baabuloon, oo halkaasay oolli doonaan
ilaa maalinta aan soo booqan doono, oo dabadeedna waan
soo qaadi doonaa oo meeshan baan ku soo celin doonaa.

**28** Oo isla sannaddaasba, bilowgii boqornimadii Sidqiyaah
uu boqorka ka ahaa dalka Yahuudah, sannaddii afraad
bisheedii shanaad ayaa Xananyaah ina Casuur oo ahaa
nebigii Gibecoon ka yimid igula hadlay guriga Rabbiga
dhexdiisa iyadoo ay wada joogaan wadaaddadii iyo dadkii
oo dhammu, oo wuxuu igu yidhi, 2 Rabbiga ciidammada
oo ah Ilaaha reer binu Israa'iil wuxuu leeyahay, Anigu
harqoodkii boqorka Baabuloon waan jebiyey. 3 Intaanay
laba sannadood dhammaan ayaan halkan ku soo celin
doonaa weelashii guriga Rabbiga oo uu Nebukadnesar oo
ah boqorka Baabuloon halkan ka qaatay, oo uu Baabuloon
la tegey. 4 Oo Rabbigu wuxuu leeyahay, Waxaan halkan ku
soo celin doonaa Yekonyaah ina Yehooyaaqiim oo ahaa
boqorkii dalka Yahuudah, iyo maxaabiistii dadka Yahuudah
ee Baabuloon lala tegey oo dhan, waayo, harqoodka boqorka
Baabuloon waan jebin doonaa. 5 Markaas Nebi Yeremyaah
baa la hadlay Nebi Xananyaah iyadoo ay wada joogaan
wadaaddadii iyo dadkii guriga Rabbiga dhex taagnaa oo
dhammu. 6 Oo Nebi Yeremyaah wuxuu yidhi, Aamiin,
Rabbigu saas ha yeelo. Rabbigu ha wada sameeyo erayadii

aad sii sheegtay oo weelashii guriga Rabbiga ha soo
celiyo, oo kuwii maxaabiis ahaanta loo kaxaystay oo dhan
Baabuloon ha ka soo celiyo oo meeshan ha keeno. 7 Hase
ahaatee bal adigu haatan maqal eraygan aan kula hadlayo
dhegahaaga iyo dhegaha dadkan oo dhan. 8 Nebiyadii
waayihii hore oo aniga iyo adigaba inaga sii horreeyey waxay
waddammo badan iyo boqortooyooyin waaweyn wax kaga
sii sheegeen dagaal iyo masiibo iyo belaayo. 9 Nebigii nabad
wax ka sii sheega, oo uu eraygii nebigaasu run noqdo,
markaas nebigaas waxaa loo aqoonsadaa in Rabbigu isaga
dhab ahaan u soo diray. 10 Kolkaasaa Nebi Xananyaah
harqoodkii qoortii Nebi Yeremyaah ka qaaday oo uu kala
jebiyey. 11 Markaasaa Xananyaah dadkii oo dhan hortiisa ku
hadlay oo wuxuu yidhi, Rabbigu wuxuu leeyahay, Sidaas oo
kale intaanay laba sannadood dhammaan ayaan quruumaha
oo dhan uga jebin doonaa harqoodka Nebukadnesar oo ah
boqorka Baabuloon. Kolkaasaa Nebi Yeremyaah iska tegey.
12 Oo markii Nebi Xananyaah uu harqoodkii ka jebiyey
qoortii Nebi Yeremyaah dabadeed ayaa eraygii Rabbigu
u yimid Nebi Yeremyaah, isagoo leh, 13 Tag, oo waxaad
Xananyaah ku tidhaahdaa, Rabbigu wuxuu kugu leeyahay,
Adigu waxaad jebisay harqoodkii qoriga ahaa, laakiinse
waxaad meeshiisa ka yeelan doontaa harqood bir ah. 14
Waayo, Rabbiga ciidammada oo ah Ilaaha reer binu Israa'iil
wuxuu leeyahay, Quruumahan oo dhan waxaan qoortooda
kor saaray harqood bir ah, si ay ugu adeegaan boqorka
Baabuloon oo ah Nebukadnesar, oo iyana way u adeegi
doonaan, oo weliba xayawaanka duurkana isagaan siiyey.
15 Markaas Nebi Yeremyaah wuxuu Nebi Xananyaah ku
yidhi, Xananyaahow, bal haatan i maqal. Rabbigu kuma
soo dirin, laakiinse waxaad dadkan ka dhigaysaa inay been
isku halleeyaan. 16 Sidaas daraaddeed Rabbigu wuxuu
leeyahay, Bal ogow, anigu waan kaa fogayn doonaa dhulka
korkiisa, oo isla sannaddan ayaad dhiman doontaa, maxaa
yeelay, waxaad ku hadashay caasinimo Rabbiga ka gees
ah. 17 Sidaas daraaddeed Nebi Xananyaah isla sannaddaas
bisheedii toddobaad ayuu dhintay.

**29** Haddaba kuwanu waa erayadii warqaddii uu Nebi
Yeremyaah Yeruusaalem uga diray kuwii hadhay ee
waayeelladii maxaabiisnimadii iyo wadaaddadii, iyo nebiyadii,
iyo dadkii uu Nebukadnesar Yeruusaalem maxaabiis
ahaanta uga kaxaystay oo uu Baabuloon la tegey oo
dhan. 2 (Taasu waxay ahayd markii Boqor Yekonyaah, iyo
boqoraddii hooyadiis ahayd, iyo bohommadii, iyo amiirradii
dadka Yahuudah iyo Yeruusaalem, iyo saanacyadii, iyo
birtumayaashiiba ay Yeruusaalem ka tageen dabadeed.) 3 Oo
wuxuu ugu sii dhiibay gacantii Elcaasaah ina Shaafaan, iyo
Gemaryaah ina Xilqiyaah (oo uu boqorkii dalka Yahuudah oo
Sidqiyaah ahaa uu u diray Baabuloon iyo ilaa Nebukadnesar
oo ahaa boqorkii Baabuloon, ) isagoo leh, 4 Rabbiga
ciidammada oo ah Ilaaha reer binu Israa'iil wuxuu leeyahay,
kuwii maxaabiis ahaanta loo kaxaystay oo dhan, oo aan ka
yeelay in Yeruusaalem laga kaxaysto oo Baabuloon lala tago,
waxaan idinku leeyahay, 5 Guryo dhista, oo ku hoyda, oo
beero beerta, oo midhahoodana cuna. 6 Naago guursada, oo
wiilal iyo gabdho dhala, oo wiilashiinnana naago u guuriya,
oo gabdhihiinnana niman siiya, si ay iyaguna wiilal iyo
gabdho u dhalaan, oo halkaasna ku tarma oo ha yaraanina.
7 Oo waxaad nabad u doondoontaan magaaladii aan idinka
yeelay in laydiin kaxaysto idinkoo maxaabiis ah, oo iyada
Rabbiga u barya, waayo, idinku nabaddeeda ayaad nabad
ku heli doontaan. 8 Waayo, Rabbiga ciidammada oo ah
Ilaaha reer binu Israa'iil wuxuu leeyahay, Nebiyadiinna iyo
waxsheegyadiinna idin dhex joogaa yaanay idin khiyaanayn,
oo idinku innaba ha dhegaysanina riyooyinkiinna aad ku
riyootaan. 9 Waayo, magacaygay wax been ah idiinku sii
sheegaan, laakiinse Rabbigu wuxuu leeyahay, Anigu iyaga
sooma aan dirin. 10 Waayo, Rabbigu wuxuu leeyahay,
Markii toddobaatan sannadood Baabuloon loo dhammeeyo
dabadeed ayaan idin soo booqon doonaa, oo waxaan
idiin oofin doonaa eraygaygii wanaagsanaa, oo halkan dib
baan idiinku soo celin doonaa. 11 Waayo, Rabbigu wuxuu
leeyahay, Anigu waan garanayaa fikirrada aan idiinku fikiro,
waana fikirro nabadeed, oo ma aha kuwa masiibeed, si
aan ugudambaystiinna rajo idiin siiyo. 12 Oo markaasaad
ii yeedhan doontaan, waanad i soo baryi doontaan, oo
aniguna waan idin maqli doonaa. 13 Oo waad i doondooni
doontaan, waanad i heli doontaan markaad qalbigiinna oo
dhan igu doondoontaan. 14 Oo Rabbigu wuxuu leeyahay,
Waad i heli doontaan, oo maxaabiisahaantiinnana waan
idinka celin doonaa, oo waxaan idinka soo wada ururin
doonaa quruumaha oo dhan iyo meelihii aan idin kexeeyey
oo dhan ayaa Rabbigu leeyahay, oo waxaan idinku soo
celin doonaa meeshii aan ka dhigay in maxaabiis ahaan
laydinkaga kaxaysto. 15 Maxaa yeelay, idinku waxaad
tidhaahdeen, Rabbiga ayaa Baabuloon nebiyo nooga dhex
kiciyey. 16 Rabbigu wuxuu ka leeyahay boqorka carshigii
Daa'uud ku fadhiya iyo dadka magaaladan deggan oo dhan,
Walaalihiinnii aan maxaabiis ahaan laydiinla kaxaysan,
17 Rabbiga ciidammadu wuxuu ka leeyahay, Bal ogaada,
waxaan korkooda ku soo dayn doonaa seef, iyo abaar,
iyo belaayo, oo waxaan iyaga ka dhigi doonaa sida midho
berde oo qudhmay oo xumaantooda aawadeed aan innaba
la cuni karin. 18 Oo waxaan iyaga ku eryan doonaa seef

iyo abaar iyo belaayo, oo waxaan ka dhigi doonaa inay
boqortooyooyinka dunida oo dhan ku dhex rogrogmadaan
hor iyo dib, oo ay inkaar iyo wax laga yaabo oo lagu foodhyo,
iyo cay ku dhex noqdaan quruumaha aan u kexeeyey oo
dhan, 19 maxaa yeelay, iyagu ma ay dhegaysan erayadaydii
aan iyaga ugu soo dhiibay nebiyadii addoommadayda ahaa,
anigoo goor wanaagsan soo diraya, laakiinse waad maqli
weydeen, ayaa Rabbigu leeyahay. 20 Haddaba maxaabiistii
aan Yeruusaalem ka diray oo aan Baabuloon u kexeeyey, bal
erayga Rabbiga maqla. 21 Rabbiga ciidammada oo ah Ilaaha
reer binu Israa'iil wuxuu leeyahay, Axaab ina Qoolaayaah
iyo Sidqiyaah ina Macaseeyaah oo magacayga been idiinku
sii sheega, bal ogaada iyaga waxaan gelin doonaa gacanta
Nebukadresar oo ah boqorka Baabuloon, oo isna indhihiinna
hortooda ayuu iyaga ku dili doonaa. 22 Oo maxaabiista
dadka Yahuudah oo Baabuloon joogta oo dhammu way
habaartami doonaan iyagoo leh, Rabbigu ha kaa dhigo sidii
Sidqiyaah iyo sidii Axaab ee uu boqorka Baabuloon dabka
ku dubay oo kale, 23 maxaa yeelay, nacasnimo ayay dalka
Israa'iil ku dhex sameeyeen, oo weliba naagihii derisyadooda
ayay ka sinaysteen, oo erayo been ah oo aanan iyaga
ku soo amrin ayay magacayga ku hadleen. Anigu kan og
baan ahay, oo markhaati baan ka ahay, ayaa Rabbigu
leeyahay. 24 Oo weliba Shemacyaah oo ah reer Nexlaamiina
waxaad ku tidhaahdaa, 25 Rabbiga ciidammada oo ah Ilaaha
reer binu Israa'iil wuxuu leeyahay, Adigu waxaad warqado
magacaaga ugu soo dirtay dadka Yeruusaalem jooga oo
dhan, iyo Sefanyaah ina Macaseeyaah oo wadaadka ah,
iyo wadaaddada oo dhanba, 26 oo waxaad tidhi, Rabbigu
wadaad buu kaaga dhigay meeshii wadaadkii Yehooyaadaac
inaad saraakiil u noqotaan guriga Rabbiga iyo inaad xabsi
ku riddid oo aad silsilado ku xidhid nin kasta oo waalan oo
nebi iska dhigaba. 27 Haddaba bal maxaad u canaanan
weyday Yeremyaah oo ah reer Canaatood oo nebi isaga
kaa dhigaya? 28 Waayo, isagu cid buu noogu soo diray
Baabuloon, oo wuxuu yidhi, Maxaabiisnimadiinnu waa muddo
dheer, haddaba guryo dhista, oo ku hoyda, oo beero beerta,
oo midhahoodana cuna. 29 Oo wadaadkii Sefanyaah ahaa
ayaa warqaddaas ku akhriyey Nebi Yeremyaah hortiisa.
30 Markaasaa eraygii Rabbigu ku soo degay Yeremyaah,
isagoo leh, 31 Kuwa maxaabiista ah oo dhan u cid dir oo
waxaad ku tidhaahdaa, Rabbigu wuxuu Shemacyaah oo
ah reer Nexlaamii ka leeyahay, Shemacyaah wax buu idiin
sii sheegay, aniguse sooma aan dirin, oo wuxuu idinka
dhigay inaad been isku hallaysaan, 32 sidaas daraaddeed
Rabbigu wuxuu leeyahay, Bal ogaada, Shemacyaah oo ah
reer Nexlaamii iyo farcankiisaba waan ciqaabi doonaa. Isagu
ma uu yeelan doono nin qudha oo dadkan dhex deggan,
oo wanaagga aan dadkayga u samayn doonona isagu ma
uu arki doono, maxaa yeelay, wuxuu ku hadlay caasinimo
Rabbiga ka gees ah, ayaa Rabbigu leeyahay.

**30** Kanu waa eraygii Yeremyaah xagga Rabbiga uga
yimid, isagoo leh, 2 Rabbiga ah Ilaaha reer binu
Israa'iil wuxuu leeyahay, Erayadii aan kugula hadlay oo
dhan kitaab ku qor. 3 Waayo, bal eeg, Rabbigu wuxuu
leeyahay, Waxaa iman doona wakhtigii aan maxaabiisnimadii
ka soo celin doono dadkayga dalka Israa'iil iyo dalka
Yahuudahba, oo waxaan iyaga ku soo celin doonaa dalkii
aan awowayaashood siiyey, oo iyana way hantiyi doonaan,
ayaa Rabbigu leeyahay. 4 Oo kuwanu waa erayadii ku
saabsanaa dadka dalka Israa'iil iyo dalka Yahuudah ee
Rabbigu ku hadlay. 5 Waayo, Rabbigu wuxuu leeyahay,
Waxaannu maqalnay cod gariir badan, oo cabsiyeed, oo
aan mid nabdeed ahayn. 6 Bal haatan weyddiiya, oo bal
eega, haddii nin ilmo dhalid la foosho iyo haddii kale? Bal
maxaan u arkaa nin kasta oo gacmihiisa dhexda ku haya
sida naag foolanaysa oo kale, iyo wejiyo wada qayirmay?
7 Hoogay wakhtigaasu waa wakhti weyn, oo ma jiro mid
isaga la mid ahu, waana wakhtigii dhibkii dadka Yacquub,
laakiinse waa laga badbaadin doonaa dhibkaas. 8 Oo
Rabbiga ciidammadu wuxuu leeyahay, Wakhtigaas ayaan
harqoodkiisa qoortaada ka jebin doonaa, oo hadhkaha kugu
xidhanna waan jari doonaa, oo shisheeyayaalna mar dambe
isaga ma addoonsan doonaan, 9 laakiinse waxay u adeegi
doonaan Rabbiga Ilaahooda ah, iyo boqorkooda Daa'uud ee
aan iyaga u sara kicin doono. 10 Sidaas daraaddeed Rabbigu
wuxuu leeyahay, Addoonkayga reer Yacquubow, ha cabsan,
reer Israa'iilow, ha nixin, waayo, bal eeg, anigu meel fog
baan kaa badbaadin doonaa, oo farcankaagana waxaan ka
badbaadin doonaa dalkii ay maxaabiis ahaanta u joogeen, oo
reer Yacquubna wuu soo noqon doonaa, oo wuxuu ku joogi
doonaa aamusnaan, iyo xasilloonaan, oo ciduna ma cabsiin
doonto. 11 Waayo, Rabbigu wuxuu leeyahay, Anigu waan
kula jiraa inaan ku badbaadsho, waayo, waan wada baabbi'in
doonaa quruumihii aan kugu dhex firdhiyey oo dhan, laakiinse
adiga ku wada baabbi'in maayo, caddaalad baanse kugu
edbin doonaa, oo sinaba ciqaabidla'aan kuugu dayn maayo.
12 Waayo, Rabbigu wuxuu leeyahay, Nabarkaagu waa mid
aan bogsan karin, oo dhaawacaaguna aad buu u xun yahay.
13 Oo innaba mid dacwadaada kuu qaada lama arko in
nabarkaaga la duubo, oo dawo wax bogsiisana ma aad
haysatid. 14 Kuwii ku jeclaan jiray oo dhammu way ku
wada illoobeen, oo innaba kuma ay doondoonaan, waayo,

waxaan kugu dhaawacay dhaawicii cadowga, iyo edbintii kan
naca weyn, waana xumaantaadii badatay aawadeed, maxaa
yeelay, dembiyadaadii way sii kordheen. **15** Bal maxaad
ula qaylinaysaa nabarkaaga? Xanuunkaagu waa mid aan
bogsan karin, waana xumaantaadii badatay aawadeed, oo
waxaan waxyaalahan kuugu sameeyey waa dembiyadaadii
sii kordhay aawadood. **16** Oo sidaas daraaddeed kuwa
ku baabbi'iya oo dhan waa la wada baabbi'in doonaa, oo
cadaawayaashaada oo dhanna midkood kastaba maxaabiis
ahaan ayaa loo kaxaysan doonaa, oo kuwa ku kala boobana
waa la kala boobi doonaa, oo kuwa ku dhacana waxaan
ka yeeli doonaa in iyagana la dhaco. **17** Waayo, Rabbigu
wuxuu leeyahay, Anigu caafimaad baan kuu soo celin
doonaa, oo dhaawacyadaadana waan kaa bogsiin doonaa,
maxaa yeelay, iyagu waxay kugu magacaabeen Mid la
nacay, oo waxay yidhaahdaan, Tanu waa Siyoon oo aan
ninna doonaynin. **18** Rabbigu wuxuu leeyahay, Bal ogaada,
maxaabiistii teendhooyinka dadka Yacquub waan soo celin
doonaa, oo meelihiisa lagu hoydona waan u naxariisan
doonaa, oo magaaladana waxaa laga dul dhisi doonaa
taallada burburkeeda, oo daarta boqorkuna siday ahaan
jirtay ayay u ahaan doontaa. **19** Oo waxaa iyaga ka soo
dhex bixi doona mahadnaqid iyo kuwa reyreeya codkood, oo
iyaga waan tarmin doonaa, oo mana ay dhinmi doonaan,
oo weliba waan sharfi doonaa, oo ma ay yaraan doonaan.
**20** Oo carruurtooduna waxay noqon doonaan sidii waayihii
hore, oo ururkooduna hortayduu ku dhismi doonaa, oo kuwa
iyaga dulma oo dhanna waan wada ciqaabi doonaa. **21**
Oo amiirkooduna iyaguu ka iman doonaa, taliyahooduna
iyaguu ka soo dhex bixi doonaa, oo isagaan ka dhigi doonaa
inuu ii soo dhowaado, oo isna wuu ii iman doonaa, waayo,
Rabbigu wuxuu leeyahay, Waa kuma kan ku dhaca inuu
ii soo dhowaado? **22** Oo idinku dadkayga waad ahaan
doontaan, aniguna Ilaahiinna baan ahaan doonaa. **23** Bal
eega, duufaankii Rabbiga ayaa soo baxay, kaasoo ah
cadhadiis, waana dabayl cirwareen ah, oo waxay ku dhici
doontaa madaxa sharrowyada. **24** Rabbiga xanaaqiisa kululu
dib u noqon maayo jeeruu sameeyo oo wada oofiyo qasdiga
qalbigiisa, oo ugudambaystana waad garan doontaan.

**31** Rabbigu wuxuu leeyahay, Isla markaasba waxaan
ahaan doonaa Ilaaha qolooyinka reer binu Israa'iil
oo dhan, oo iyana dadkaygay ahaan doonaan. **2** Rabbigu
wuxuu leeyahay, Markaan u soo kacay inaan isaga nasiyo
ayay dadkii seefta ka baxsaday naxariis ka heleen cidladii,
waana reer binu Israa'iil. **3** Rabbigu waa horuu ii muuqday,
oo wuxuu igu yidhi, Waxaan kugu jeclaaday jacayl daa'im
ah, oo sidaas daraaddeed raxmad baan kugu soo jiitay.
**4** Dadka Israa'iil ee bikradda ahow, mar kalaan ku dhisi
doonaa, oo waad dhismi doontaa, oo waxaad mar kale
isku sharrixi doontaa dafafkaagii, oo waxaad cayaaraha ula
bixi doontaa kuwa reyreeya. **5** Oo weliba waxaad canab
ku beeran doontaa buuraha Samaariya, oo beeraleydu
wax bay beeran doonaan, oo midhahoodana way ku farxi
doonaan. **6** Waxaa iman doona wakhti waardiyayaasha
buuraha Efrayim kor saaranu ay ku dhawaaqi doonaan, Sara
joogsada oo aynu Rabbiga Ilaaheena ah Siyoon ugu kacnee.
**7** Waayo, Rabbigu wuxuu leeyahay, Reer Yacquub aawadiis
farxad ugu heesa, oo waxaad u dhawaaqdaan kan madaxa
quruumaha ah aawadiis. Naadiya, oo ammaana, oo waxaad
tidhaahdaan, Rabbiyow, dadkaaga ah kuwa reer binu Israa'iil
ka hadhay badbaadi. **8** Bal ogaada, waxaan iyaga ka soo
kaxayn doonaa dalka woqooyi, waanan ka soo ururin doonaa
dhulka darafyadiisa, oo waxaan iyaga la soo keeni doonaa
indhoolaha iyo curyaanka, iyo naagtii uur leh, iyo tii ilmo la
foolanaysa. Iyagoo guuto weyn ah ayay halkan ku soo noqon
doonaan. **9** Iyagoo ooyaya bay iman doonaan, oo anoo qalbi
qaboojinaya ayaan soo hor kici doonaa, oo waxaan iyaga soo
ag marin doonaa durdurro biya ah iyo jid toosan oo ayan ku
dhex turunturoon doonin, waayo, aabbaan reer binu Israa'iil
u ahay, oo Efrayimna waa curadkaygii. **10** Quruumahow,
Rabbiga eraygiisa maqla, oo gasiiradaha fog ka dhex
naadiya, oo waxaad tidhaahdaan, Kii reer binu Israa'iil kala
firdhiyey wuu soo ururin doonaa, oo wuxuu u ilaalin doonaa
siduu adhijir adhigiisa u ilaaliyo oo kale. **11** Waayo, Rabbigu
reer Yacquub wuu soo furtay, oo wuxuu ka soo badbaadiyey
gacantii kii isaga ka xoogga badnaa. **12** Oo intay yimaadaan
ayay meesha sare ee Siyoon ka dul heesi doonaan, oo
waxay u soo wada qulquli doonaan Rabbiga wanaaggiisa oo
ah hadhuudh, iyo khamri, iyo saliid, iyo ubadka idaha iyo
lo'daba, oo naftooduna waxay noqon doontaa sida beer la
waraabiyey oo kale, oo mar dambena innaba weligood ma
ay murugoon doonaan. **13** Oo markaasay bikraddu cayaarta
ku dhex rayrayn doonta, oo barbaarrada iyo odayaashuba
ay wada farxi doonaan, waayo, baroorashadoodii farxad
baan ugu beddeli doonaa, waanan u qalbi qaboojin doonaa,
oo waxaan ka dhigi doonaa inay murugtoodii ka reyreeyaan.
**14** Oo Rabbigu wuxuu leeyahay, Wadaaddada naftooda aad
baan u dhergin doonaa, oo dadkayguna wanaaggaygay
ka dhergi doonaan. **15** Rabbigu wuxuu leeyahay, Cod baa
Raamaah laga maqlay, baroorasho iyo oohin qadhaadh,
oo Raaxeel carruurteeday u ooyaysaa, wayna diiddaa in
carruurteeda looga qalbi qaboojiyo, waayo, ma ay joogaan.
**16** Rabbigu wuxuu leeyahay, Codkaaga oohinta ka jooji,

oo indhahaagana ilmada ka celi, waayo, Rabbigu wuxuu
leeyahay, Shuqulkaaga waa lagaaga abaalgudi doonaa,
oo iyagu mar kalay ka iman doonaan dalkii cadowga. 17
Oo Rabbigu wuxuu leeyahay, Ugudambaystaadana rajaa
kuu jirta, oo carruurtaaduna mar kalay waddankooda ku
soo noqon doonaan. 18 Sida xaqiiqada ah waxaan maqlay
Efrayim oo ku barooranaya, Adigu waad i edbisay, oo waxaa
la ii edbiyey sidii dibi layli ah oo aan harqoodka u baran.
I soo celi, oo aniguna waan soo noqon doonaa, waayo,
Rabbiga Ilaahayga ah ayaad tahay. 19 Hubaal markaan
soo noqday ayaan toobadkeenay, oo markii lay waaniyeyna
bowdadaan dharbaaxay, oo waan ceeboobay, oo xataa waan
sharafjabay, waayo, waxaan weli sitay ceebtii yaraantayda.
20 Rabbigu wuxuu leeyahay, Efrayim ma wiilkayga aan aad u
jeclahay baa? Oo ma wiil aan ku farxo baa? Waayo, mar alla
markii aan wax isaga ka gees ah ku hadlo, aad baan isaga u
xusuustaa, oo aawadiis ayaa uurku ii gubtay. Hubaal waan u
naxariisan doonaa. 21 Calaamado samayso, oo tiirar jidka
lagu garto qotonso, oo qalbigaaga u soo jeedi xagga jidka
weyn, kaasoo ah jidkii aad markii hore ku tagtay. Dadka
Israa'iil ee bikradda ahow, soo noqo. Magaalooyinkaagan ku
soo noqo. 22 Kaaga sida bikrad dib u socdow, ilaa goormaad
iska daba wareegaysaa? Waayo, Rabbigu wax cusubuu
dhulka ku sameeyey, oo naag baa nin ku wareegi doonta.
23 Rabbiga ciidammada oo ah Ilaaha reer binu Israa'iil
wuxuu leeyahay, Hadalkan ayay mar kale kaga dhex hadli
doonaan dalka Yahuudah iyo magaalooyinkiisaba, markaan
maxaabiistooda dib u soo celiyo, oo waxay odhan doonaan,
Hoyga caddaaladda, iyo buurta quduuska ahay, Rabbigu ha
ku barakeeyo. 24 Xaggaas waxaa degganaan doona dadka
dalka Yahuudah iyo magaalooyinkiisa oo dhanba, kuwaasoo
beeraley iyo kuwa xoolodhaqato ah. 25 Waayo, naf kasta oo
daallan ayaan wabxiyey, oo naf kasta oo murugaysanna
waan dhergiyey. 26 Markaasaan toosay, oo wax baan fiiriyey,
oo hurdadaydiina way ii macaanayd. 27 Rabbigu wuxuu
leeyahay, Bal ogaada, waxaa iman doona wakhti aan dalka
Israa'iil iyo dalka Yahuudahba ku dhex beeri doono abuur dad
iyo duunyoba. 28 Oo Rabbigu wuxuu leeyahay, Waxay noqon
doontaa in sidaan iyaga ugu dhawray inaan rujiyo, oo aan
dumiyo, oo aan afgembiyo, oo aan baabbi'iyo, oo aan wada
dhibo, sidaas oo kale ayaan iyaga ugu dhawri doonaa inaan
dhiso, oo aan beero. 29 Oo wakhtigaas iyagu mar dambe
ma ay odhan doonaan, Aabbayaashii waxay cuneen canab
dhanaan, carruurtiina way saliilyoodeen. 30 Laakiinse mid
kastaaba wuu u dhiman doonaa xumaantiisa, oo nin kasta
oo canab dhanaan cunaaba wuu saliilyoon doonaa. 31 Bal
eega, maalmihii waa imanayaan, ayaa Rabbigu leeyahay, oo
anigu axdi cusub baan la dhigan doonaa reer Israa'iil iyo reer
Yahuudah, 32 oo aan ahayn axdigii aan awowayaashood
la dhigtay oo kale, maalintii aan iyaga gacanta qabtay
inaan ka kaxeeyo dalka Masar. Iyagu axdigaygaas way
jebiyeen in kastoo aan iyaga sayid u ahaa, ayaa Rabbigu
leeyahay. 33 Laakiinse kanu waa axdiga aan la dhigan
doono reer Israa'iil maalmahaas dabadood, ayaa Rabbigu
leeyahay. Sharcigayga waxaan gelin doonaa uurkooda, oo
qalbigoodana waan ku qori doonaa, oo Ilaahooda waan
ahaan doonaa, iyaguna dadkaygay ahaan doonaan. 34
Mar dambe nin kastaaba deriskiisa wax ma bari doono, oo
nin kastaaba walaalkiis wax ma bari doono, isagoo ku leh,
Rabbiga garo, waayo, kulli way i garan doonaan, kooda
ugu yar ilaa kooda ugu weynba, ayaa Rabbigu leeyahay,
waayo, xumaantooda waan cafiyi doonaa, oo dembigoodana
kol dambe ma xusuusan doono. 35 Rabbiga qorraxda
maalintii nuurka ka dhiga, oo qaynuunnada dayaxa iyo
xiddigaha ka dhiga inay habeenkii nuuraan, oo baddana
kiciya si ay mawjadaheedu u guuxaan, oo magiciisa la
yidhaahdo Rabbigii ciidammada, wuxuu leeyahay: 36 Haddii
qaynuunnadaasu ay hortayda ka tagaan, farcanka reer
binu Israa'iilna way ka joogsan doonaan inay weligoodba
hortayda quruun ku ahaadaan. 37 Rabbigu wuxuu leeyahay,
Haddii samada sare la qiyaasi karo, amase aasaaska dhulka
hoose la soo baadhi karo, markaas aniguna farcanka reer
binu Israa'iil oo dhan waan u wada xoori doonaa wixii ay
sameeyeen oo dhan aawadood, ayaa Rabbigu leeyahay. 38
Oo haddana Rabbigu wuxuu leeyahay, Bal ogaada, waxaa
iman doona wakhti Rabbiga magaalada looga dhisi doono
munaaradda Xananeel iyo tan iyo iridda rukunka. 39 Oo
xadhigga qiyaastuna wuxuu hore ugu sii gudbi doonaa tan iyo
buurta Gaareeb oo ka sii horraysa, oo xagga Gocaahna wuu
u jeedsan doonaa. 40 Oo dhammaan dooxada meydadka,
iyo dambaskaba, iyo beeraha oo dhan tan iyo durdurka
Qidroon iyo ilaa iridda faraska oo dhanka bari u jeeddaba
quduus bay Rabbiga u ahaan doonaan, oo weligeedna mar
dambe lama rujin doono, lamana dumin doono.

32 Kanu waa eraygii Yeremyaah xagga Rabbiga uga
yimid sannaddii tobnaad ee Sidqiyaah oo ahaa boqorkii
dalka Yahuudah, oo kaasu wuxuu ahaa sannaddii siddeed
iyo tobnaad oo Nebukadresar. 2 Markaasaa ciidankii
boqorka Baabuloon Yeruusaalem hareereeyeen. Oo Nebi
Yeremyaahna wuxuu ku xidhnaa barxaddii xabsigii ku dhex
yiil gurigii boqorka dalka Yahuudah. 3 Waayo, Sidqiyaah
oo ahaa boqorkii dalka Yahuudah ayaa isaga xidhay, oo
wuxuu ku yidhi, War maxaad wax u sii sheegtaa, adigoo
leh, Rabbigu wuxuu leeyahay, Bal ogaada, magaaladan

waxaan gelin doonaa gacanta boqorka Baabuloon, oo isna
wuu qabsan doonaa, 4 oo Sidqiyaah oo ah boqorka dalka
Yahuudah gacanta reer Kaldayiin kama uu baxsan doono,
laakiinse hubaal waxaa la gelin doonaa gacanta boqorka
Baabuloon, oo isna afkiisuu kula hadli doonaa, oo indhahana
way isku arki doonaan, 5 oo isna Sidqiyaah ayuu u kaxaysan
doonaa Baabuloon oo halkaasuu joogi doonaa ilaa aan
isaga soo booqdo, ayaa Rabbigu leeyahay; oo in kastoo
aad reer Kaldayiin la dirirtaan innaba ma liibaani doontaan?
6 Oo Yeremyaahna wuxuu yidhi, Eraygii Rabbiga ayaa ii
yimid, oo wuxuu igu yidhi, 7 Bal eeg, waxaa kuu iman
doona ina-adeerkaa Xanameel ina Shalluum, oo wuxuu
kugu odhan doonaa, Beertayda Canaatood ku taal iga iibso,
waayo, adigaa furashada xaq u leh inaad iga iibsatid. 8
Markaasaa ina-adeerkay Xanameel iigu yimid barxaddii
xabsiga sidii erayga Rabbigu ahaa, oo wuxuu igu yidhi,
Waan ku baryayaaye beertayda ku taal Canaatood oo
dalka reer Benyaamiin ku dhex taal iga iibso, waayo, inaad
dhaxasho adigaa xaq u leh, oo furashadeedana adigaa
leh, haddaba soo iibso, oo markaasaan ogaaday in kaasu
Eraygii Rabbiga yahay. 9 Markaasaan iibsaday ina-adeerkay
Xanameel beertiisii Canaatood ku tiil, oo isagaan lacagtii
u miisaamay taasoo ahayd toddoba iyo toban sheqel oo
lacag ah. 10 Oo intaan warqaddii heshiiska qoray ayaan
shaabadeeyey, oo markaasaan markhaatiyaal u yeedhay oo
isagaan lacagtii kafado ugu miisaamay. 11 Kolkaasaan qaatay
warqadihii heshiiska waxiibsashada, tii shaabadaysnayd iyo
tii furnaydba, si waafaqsan sharciga iyo caadada. 12 Oo
markaasaan warqaddii heshiiska waxiibsashada u dhiibay
Baaruug ina Neeriiyaah oo ka sii ahaa ina Maseeyaah,
iyadoo uu u jeedo ina-adeerkay Xanameel, oo waxaan ugu
hor dhiibay markhaatiyaashii warqadda heshiiska saxeexay,
iyo Yuhuuddii xabsiga barxaddiisa fadhiday oo dhan. 13
Oo waxaan Baaruug ku amray hortooda, oo ku idhi, 14
Rabbiga ciidammada oo ah Ilaaha reer binu Israa'iil wuxuu
leeyahay, Qaad warqadahan heshiiska waxiibsashada,
midda shaabadaysan, iyo tan furanba, oo waxaad ku dhex
riddaa jalxad dhooba ah, si ay wakhti dheer u sii raagaan.
15 Waayo, Rabbiga ciidammada oo ah Ilaaha reer binu
Israa'iil wuxuu leeyahay, Weliba mar dambe dalkan waxaa
laga iibsan doonaa guryo iyo beero canab ah. 16 Oo
markaan warqaddii heshiiska waxiibsashada Baaruug ina
Neeriiyaah u dhiibay dabadeed ayaan Ilaah baryay oo
waxaan ku idhi, 17 Sayidow, Rabbiyow, bal eeg, samada iyo
dhulkaba xooggaaga badan iyo gacantaada fidsan ayaad ku
samaysay, oo wax kugu adagna ma jiro. 18 Kumanyaal baad
u naxariisataa, oo xumaantii aabbayaashu sameeyaanna
waxaad abaalmarin ugu soo celisaa laabta carruurtooda
iyaga ka dambaysa. Magacaagu waa Ilaaha xoogga badan
ee weyn, iyo Rabbiga ciidammada. 19 Xagga talada waad
ku weyn tahay, oo xagga shuqulkana waad ku xoog badan
tahay. Indhahaagu way u furan yihiin jidadka binu-aadmiga
oo dhan, si aad mid kasta ugu abaalmarisid sidii jidkiisu ahaa
iyo sidii midhaha falimihiisu ay ahaayeen. 20 Waxaad ilaa
maantadan calaamooyin iyo yaababba ku dhex samaysay
dalkii Masar, iyo reer binu Israa'iil dhexdooda, iyo dadka kale
dhexdoodaba, oo magac baad samaysatay siday maantadan
tahay. 21 Oo dadkaaga reer binu Israa'iilna dalkii Masar
baad kaga soo bixisay calaamooyin, iyo yaabab, iyo gacan
xoog badan, iyo dhudhun fidsan, iyo cabsi weyn. 22 Oo
iyagaad siisay dalkan aad awowayaashood ugu dhaaratay
inaad iyaga siinaysid kaasoo ah dal caano iyo malab la
barwaaqaysan, 23 oo iyana intay soo galeen ayay hantiyeen,
laakiinse codkaagii ma ay addeecin, oo sharcigaagiina kuma
ay socon, oo waxyaalihii aad ku amartay inay sameeyaanna
waxba kama ay samayn, oo sidaas daraaddeed ayaad ka
dhigtay in masiibadan oo dhammu ay ku dhacdo. 24 Bal
eeg tuulmooyinka! Magaalada waa loo yimid in la qabsado,
oo waxaa magaaladii la geliyey gacantii reer Kaldayiinkii
iyada la diriray, waana seefta iyo abaarta iyo belaayada
aawadood. Wixii aad ku hadashay way ahaadeen, oo bal
eeg, adiguba waad u jeeddaa. 25 Sayidow, Rabbiyow,
waxaad igu tidhi, Beerta lacag ku iibso, oo markhaatiyaal
u yeedh, waayo, magaalada waxaa lagu riday gacanta
reer Kaldayiin. 26 Markaasaa Yeremyaah waxaa u yimid
Eraygii Rabbiga oo ku leh, 27 Bal eeg, anigu waxaan ahay
Rabbiga ah Ilaaha binu-aadmiga oo dhan, haddaba ma wax
igu adag baa jira? 28 Sidaas daraaddeed Rabbigu wuxuu
leeyahay, Bal ogaada, Anigu magaaladan waxaan gelin
doonaa gacanta reer Kaldayiin, iyo gacanta Nebukadresar
oo ah boqorka Baabuloon, oo isna wuu qabsan doonaa. 29
Oo reer Kaldayiinka magaaladan la dirirayaana way iman
doonaan, oo dab bay magaaladan qabadsiin doonaan, oo
way gubi doonaan iyada iyo guryaheedii ay saqafkooda Bacal
foox ugu shidi jireen, oo ay qurbaanno cabniin ah ilaahyada
kale ugu shubi jireen, oo sidaasay iiga cadhaysiiyeen.
30 Waayo, dadka Israa'iil iyo dadka Yahuudahba waxay
tan iyo yaraantoodii hortayda ku sameeyeen shar keliya,
waayo, Rabbigu wuxuu leeyahay, Reer binu Israa'iil waxaa
keliya oo ay sameeyeen inay shuqulka gacmahooda igaga
cadhaysiiyaan. 31 Waayo, magaaladanu waxay ii ahayd
wax iga dhirfiya oo iga cadhaysiiya tan iyo maalintii ay
dhiseen iyo ilaa maantadan la joogo inta ka dhex leh, oo
sidaas daraaddeed ayaan wejigayga uga hor fogayn doonaa,

32 waana sharkii dadka Israa'iil iyo dadka Yahuudah ay
igaga cadhaysiiyeen oo dhan, iyaga, iyo boqorradooda,
iyo amiirradooda, iyo wadaaddadooda, iyo nebiyadooda,
iyo dadka Yahuudah, iyo kuwa Yeruusaalem deggan. 33
Oo iyagu dhabarkay ii soo jeediyeen, wejigiina way iga
sii jeediyeen, oo in kastoo aan iyaga wax baray, anigoo
goor wanaagsan wax baraya, inay tacliin qaataan innaba
ma ay dhegaysan. 34 Laakiinse karaahiyooyinkoodii ayay
dhex qotomiyeen gurigii laygu magacaabay gudihiisa oo
sidaasay u nijaaseeyeen. 35 Oo weliba waxay dhiseen
meelaha sarsare ee Bacal oo ku dhex yaal dhooxada ina
Xinnom si ay wiilashooda iyo gabdhahoodaba dab u dhex
marsiiyaan Moleg aawadiis, taasoo aanan iyaga ku amrin,
oo aan innaba qalbigayga soo gelin, inay karaahiyadan
sameeyaan oo ay dadka Yahuudah dembaajiyaan. 36
Haddaba sidaas daraaddeed Rabbiga ah Ilaaha reer binu
Israa'iil wuxuu ka leeyahay magaaladan aad tidhaahdeen,
Waxay boqorka Baabuloon ugu gacangeli doontaa seef iyo
abaar iyo belaayo, 37 Bal ogaada, waxaan iyaga ka soo dhex
ururin doonaa waddammadii aan xanaaqayga iyo dhirifkayga
iyo cadhada weyn ugu kexeeyey oo dhan, oo meeshan
ayaan mar kale ku soo celin doonaa, oo waxaan ka dhigi
doonaa inay ammaan ku degganaadaan. 38 Iyagu waxay
ahaan doonaan dadkaygii, oo anna Ilaahood baan ahaan
doonaa. 39 Oo waxaan iyaga siin doonaa qalbi qudha iyo jid
qudha, si ay weligoodba iiga cabsadaan, waana inay iyaga
iyo carruurtooda ka dambaysaba wanaag helaan. 40 Oo
waxaan iyaga la dhigan doonaa axdi weligiisba sii waaraya,
si aanan marnaba uga sii jeesan inaan iyaga wanaag u
sameeyo, oo qalbigooda ayaan cabsidayda gelin doonaa, si
ayan iiga tegin aawadeed. 41 Waxaan ku farxi doonaa inaan
iyaga wanaag u sameeyo, oo sida runta ah qalbigayga oo
dhan iyo naftayda oo dhan ayaan iyaga dalkan ku dhex beeri
doonaa. 42 Waayo, Rabbigu wuxuu leeyahay, Sidaan dadkan
ugu soo dejiyey masiibadan weyn oo dhan ayaan wanaaggii
aan u ballanqaaday oo dhan ugu soo dejin doonaa. 43 Oo
beeraa laga iibsan doonaa dalkan aad tidhaahdaan, Waa
cidla aan dad iyo duunyo toona lahayn oo waxaa lagu riday
gacanta reer Kaldayiin. 44 Dad baa beero lacag kaga iibsan
doona dalka reer Benyaamiin iyo meelaha Yeruusaalem ku
wareegsan oo dhan, iyo magaalooyinka dalka Yahuudah,
iyo magaalooyinka buuraha ku yaal, iyo magaalooyinka
dooxada ku yaal, iyo magaalooyinka koonfureedba, oo
warqadda heshiiskana way qori doonaan oo shaabadayn
doonaan, oo markhaatiyaalna way u yeedhi doonaan, waayo,
anigu maxaabiistooda waan soo celin doonaa ayaa Rabbigu
leeyahay.

33 Oo haddana Eraygii Rabbiga ayaa Yeremyaah mar
labaad u yimid intuu weli barxaddii xabsiga ku xidhnaa,
oo wuxuu ku yidhi, 2 Rabbiga waxyaalahaas sameeya,
oo u yeela inuu sii adkeeyo aawadeed, magiciisu waa
Rabbiga, oo wuxuu leeyahay, 3 I bari, waanan kuu jawaabi
doonaa, oo waxaan ku tusi doonaa waxyaalo waaweyn oo
qarsoon oo aadan aqoon. 4 Waayo, Rabbiga ah Ilaaha reer
binu Israa'iil wuxuu ka leeyahay guryaha magaaladan iyo
guryaha boqorrada dalka Yahuudah oo loo dumiyey in la
sameeyo wax lagaga daafaco tuulmooyinkii dagaalka iyo
seefta, 5 Iyagu waxay u imanayaan inay reer Kaldayiin
la diriraan, laakiinse waxay meeshan ka buuxin doonaan
dad dhintay meydadkood, kuwaasoo aan cadhadayda iyo
xanaaqayga ku laayay, oo aan dhammaantood xumaantooda
aawadeed magaaladan wejigayga uga qariyey. 6 Bal ogaada,
anigu waxaan iyada u keeni doonaa caafimaad iyo fayoobi,
waanan bogsiin doonaa, oo waxaan iyaga u muujin doonaa
nabad iyo run badan. 7 Oo maxaabiistii dadka Yahuudah,
iyo maxaabiistii dadka Israa'iilba waan soo celin doonaa,
oo iyagaan u dhisi doonaa sidii markii hore oo kale. 8
Xumaantoodii ay igu dembaabeen oo dhan waan ka nadiifin
doonaa, oo xumaatooyinkoodii ay igu dembaabeen oo ay
igu xadgudbeen oo dhanna waan ka cafiyi doonaa. 9 Oo
magaaladanu waxay igu noqon doontaa magac farxadeed,
oo ammaan iyo sharaf ku hor leh quruumaha dunida oo
maqli doona wanaagga aan iyaga u sameeyo oo dhan
hortooda, oo iyagu waxay la cabsan doonaan oo la wada
gariiri doonaan wanaagga iyo nabadda aan u yeelo oo dhan.
10 Rabbigu wuxuu leeyahay, Meeshan aad tidhaahdaan,
Waa cidla aan dad iyo duunyo toona lahayn, taasoo ah
magaalooyinka dalka Yahuudah iyo jidadka Yeruusaalem,
oo ah baabba' cidla ah, oo aan lagu arag dad, iyo wax
deggan, iyo duunyo toona, waxaa mar kale laga dhex maqli
doonaa 11 codka farxadda, iyo codka rayraynta, iyo codka
arooska, iyo codka aroosadda, iyo codka kuwa leh, Rabbiga
ciidammada u mahadnaqa, waayo, Rabbigu waa wanaagsan
yahay, oo naxariistiisuna weligeedba way waartaa, iyo kuwa
guriga Rabbiga allabaryo mahadnaqid ah keena. Waayo,
maxaabiista dalka waan soo celin doonaa sidii markii hore
oo kale, ayaa Rabbigu leeyahay. 12 Rabbiga ciidammadu
wuxuu leeyahay, Meeshan cidlada ah oo aan dad iyo duunyo
toona lahayn, iyo magaalooyinkeeda oo dhanba waxaa
mar kale jiri doona rug adhijirro adhyahooda fadhiisiya. 13
Magaalooyinka buuraha, iyo magaalooyinka dooxada, iyo
magaalooyinka koonfureed, iyo dalka reer Benyaamiin, iyo
meelaha Yeruusaalem ku wareegsan, iyo magaalooyinka
dalka Yahuudahba adhyuhu mar kalay hoos mari doonaan

kan tirinaya gacmihiisa, ayaa Rabbigu leeyahay. 14 Rabbigu
wuxuu leeyahay, Bal eega, waxaa iman doona wakhti aan
wada oofin doona wixii wanaagsanaa ee aan dadka Israa'iil
iyo dadka Yahuudahba kaga hadlay. 15 Wakhtigaas iyo
waagaasba waxaan Daa'uud u soo bixin doonaa biqil xaq ah,
oo isna wuxuu dalka ku dhex samayn doonaa caddaalad iyo
xaqnimo. 16 Wakhtigaas dadka Yahuudah waa la badbaadin
doonaa, oo Yeruusaalemna ammaan bay ku degganaan
doontaa, oo kanuna waa magaca iyada lagu magacaabi
doono, Rabbigu waa xaqnimadayadii. 17 Waayo, Rabbigu
wuxuu leeyahay, Daa'uud marnaba ma waayi doono nin
carshiga reer binu Israa'iil ku fadhiista. 18 Oo wadaaddada
reer Laawina marnaba ma waayi doonaan nin hortayda
jooga inuu qurbaanno la gubo bixiyo, iyo inuu qurbaanno
hadhuudh ah gubo, iyo inuu had iyo goorba allabaryo. 19
Oo haddana Eraygii Rabbiga ayaa Yeremyaah u yimid,
oo wuxuu ku yidhi, 20 Rabbigu wuxuu leeyahay, Haddaad
jebin karaysaan axdigayga habeenka, amase axdigayga
maalinta, si habeen iyo maalinu ayan xilligooda u ahaanin, 21
markaas axdigayga aan addoonkayga Daa'uud la dhigtayna
waa jabi karayaa si uusan u helin wiil carshigiisa ka dul
taliya, iyo kii aan la dhigtay wadaaddada reer Laawi oo
midiidinnadayda ah. 22 Sida aan ciidammada samada loo
tirin karin, amase aan ciidda badda loo qiyaasi karin, ayaan
u tarmin doonaa farcanka addoonkayga Daa'uud, iyo reer
Laawiga ii adeegaba. 23 Oo haddana Eraygii Rabbiga ayaa
Yeremyaah u yimid, oo wuxuu ku yidhi, 24 Miyaadan ka
fikirayn waxa dadkanu ku hadleen iyagoo leh, Labadii qolo ee
uu Rabbigu doortayba wuu xooray? Oo saasay dadkayga u
quudhsadaan si ayan iyagu mar dambe hortooda quruun ugu
ahaan. 25 Rabbigu wuxuu leeyahay, Hadduusan axdigayga
habeenka iyo maalintu sii jirin, ama haddaanan waajib ka
dhigin qaynuunnada samada iyo dhulkaba, 26 markaas
waxaan xoori doonaa farcankii Yacquub, iyo addoonkaygii
Daa'uudba, si aanan farcankiisa qaarna uga dhigin inay
taliyayaal u ahaadaan farcankii Ibraahim, iyo Isxaaq, iyo
Yacquub, waayo, maxaabiistooda waan soo celin doonaa,
waanan u naxariisan doonaa.

34 Kanu waa eraygii Yeremyaah xagga Rabbiga uga yimid
waagii Nebukadnesar oo ahaa boqorkii Baabuloon, iyo
ciidankiisii oo dhan, iyo boqortooyooyinkii dunida oo taliskiisa
ku jiray oo dhan, iyo dadkii oo dhammuba ay la dirirayeen
Yeruusaalem iyo magaalooyinkeedii oo dhan, oo wuxuu ku
yidhi, 2 Rabbiga ah Ilaaha reer binu Israa'iil wuxuu leeyahay,
Tag oo Sidqiyaah oo ah boqorka dalka Yahuudah la hadal,
oo waxaad ku tidhaahdaa, Rabbigu wuxuu leeyahay, Bal
ogow, magaaladan waxaan ku ridi doonaa gacanta boqorka
Baabuloon, oo isna dab buu ku gubi doonaa. 3 Oo adiguna
gacantiisa kama aad baxsan doontid, laakiinse hubaal waa
lagu qabsan doonaa, oo gacantiisaa lagugu ridi doonaa,
oo indhahaaguna waxay fiirin doonaan indhaha boqorka
Baabuloon, oo isna afkiisuu kula hadli doonaa, oo Baabuloon
baad tegi doontaa. 4 Sidqiyaah boqorka dalka Yahuudahow,
Weliba bal maqal erayga Rabbiga. Rabbigu wuxuu kaa
leeyahay, Seef kuma dhiman doontid, 5 nabad baadse ku
dhiman doontaa, oo wax baa laguu shidi doonaa sidii wax
loogu shidi jiray awowayaashaa oo ahaa boqorradii kaa
sii horreeyey, wayna kuu barooran doonaan, iyagoo leh,
Hoogaye, sayidkaygiiyow, waayo, Rabbigu wuxuu leeyahay,
Eraygaas anigaa ku hadlay. 6 Markaas Nebi Yeremyaah
wuxuu erayadaas oo dhan Yeruusaalem kagala hadlay
Sidqiyaah oo ahaa boqorkii dalka Yahuudah, 7 markii
boqorkii Baabuloon ciidankiisii uu la dirirayay Yeruusaalem,
iyo magaalooyinkii dalka Yahuudah oo hadhay oo dhan, iyo
xataa Laakiish iyo Caseeqaah, waayo, magaalooyinkaas
deyrka lahaa ayaa ka hadhay magaalooyinkii dalka Yahuudah
oo dhan. 8 Kanu waa eraygii Yeremyaah xagga Rabbiga
uga yimid markii Boqor Sidqiyaah uu dadkii Yeruusaalem
degganaa oo dhan axdi la dhigtay dabadeed. Axdigaasuna
waa in xorriyad loogu dhawaaqo, 9 in nin kastaaba xoreeyo
addoonkiisii Cibraaniga ah ama addoontiisii Cibraaniyadda
ah, iyo inuusan ninna addoonsan walaalkiisa Yuhuudi ah.
10 Haddaba amiirradii iyo dadkii axdiga galay oo dhammu
markay maqleen inay nin kasta waajib ku tahay inuu xoreeyo
addoonkiisa iyo addoontiisaba, iyo inaan ninna iyaga mar
dambe addoonsan ayay amarkaas addeeceen oo way sii
wada daayeen iyagii. 11 Laakiinse markaas dabadeed ayay
ku noqdeen, oo waxay soo ceshadeen addoommadii ay mar
hore sii daayeen, oo iyagay u gumaysteen inay addoommo u
sii ahaadaan. 12 Sidaas daraaddeed eraygii Rabbigu wuxuu
xagga Rabbiga uga yimid Yeremyaah isagoo leh, 13 Rabbiga
ah Ilaaha reer binu Israa'iil wuxuu leeyahay, Anigu axdi
baan awowayaashiin la dhigtay maalintii aan iyaga dalkii
Masar iyo gurigii addoonsiga ka soo bixiyey, oo waxaan ku
idhi, 14 Markay toddoba sannadood dhammaystaan midkiin
kastaaba ha sii daayo walaalkiisa Cibraaniga ah oo is-iibiyey,
oo markuu kuu adeego lix sannadood waa inaad isaga sii
daysaa isagoo xor kaa ah. Laakiinse awowayaashiin ima
ay maqlin, oo dhegna iima ay dhigin. 15 Idinkuse haatan
waad soo noqoteen, oo wax qumman ayaad hortayda ku
samayseen markii ninkiin kastaaba uu deriskiisa xorriyad ugu
dhawaaqay, oo axdi baad hortayda ku gasheen idinkoo gurigii
laygu magacaabay jooga. 16 Laakiinse intaad iga noqoteen

ayaad magacaygii nijaasayseen, oo ninkiin kastaaba wuxuu
soo ceshaday addoonkiisii iyo addoontiisii uu ikhtiyaarkooda
ku xoreeyey, oo waxaad ku soo celiseen gumaysi inay
addoommo idiin sii ahaadaan. 17 Sidaas daraaddeed
Rabbigu wuxuu leeyahay, Idinku ima aydaan maqlin, in nin
kastaa xorriyad ugu dhawaaqo walaalkiis iyo deriskiisa.
Bal ogaada, Rabbigu wuxuu leeyahay, Waxaan idinku
dhawaaqayaa xorriyad, taasoo ah in seef, iyo belaayo,
iyo abaaru ay idin baabbi'iyaan, oo waxaan idinka dhigi
doonaa inaad boqortooyooyinkii dunida oo dhan hore iyo
dib ku dhex rogrogmataan. 18 Oo nimankii axdigayga ku
xadgudbay, oo aan oofin erayadii axdiga ee ay hortayda
ku galeen markay weysha laba u kala gooyeen oo ay
qaybaheedii kala dhex mareen, 19 kuwaasoo ah amiirradii
dalka Yahuudah, iyo amiirradii Yeruusaalem, iyo bohommadii,
iyo wadaaddadii, iyo dadkii dalka oo qaybihii weysha kala
dhex maray oo dhan, 20 waxaan kulligood ku wada ridi
doonaa gacanta cadaawayaashooda, iyo gacanta kuwa
naftooda doondoonaya, oo meydkooduna wuxuu cunto u
noqon doonaa haadka samada iyo dugaagga dhulka. 21 Oo
Sidqiyaah oo ah boqorka dalka Yahuudah, iyo amiirradiisaba
waxaan ku ridi doonaa gacanta cadaawayaashooda, iyo
gacanta kuwa naftooda doondoonaya, iyo gacanta ciidanka
boqorka Baabuloon oo haatan idinka noqday. 22 Rabbigu
wuxuu leeyahay, Bal ogaada, anigu waan amri doonaa oo
waxaan ka yeeli doonaa inay magaaladan ku soo noqdaan,
wayna la diriri doonaan, oo qabsan doonaan, oo dab bay ku
gubi doonaan, oo waxaan magaalooyinka dalka Yahuudah
ka dhigi doonaa cidla' aan ciduna degganayn.

**35** Kanu waa eraygii Yeremyaah xagga Rabbiga uga yimid
wakhtigii Yehooyaaqiim ina Yoosiyaah uu boqorka ka
ahaa dalka Yahuudah, oo wuxuu ku yidhi, 2 Waxaad u tagtaa
reer Reekaab, oo la hadal, oo guriga Rabbiga qolladihiisa
middood geli, waxaanad siisaa khamri ay cabbaan. 3
Markaasaan soo kaxaystay Ya'asanyaah ina Yeremyaah oo
ahaa ina Habasinyaah, iyo walaalihiis, iyo wiilashiisii oo dhan,
iyo qoyskii reer Reekaab oo dhan, 4 oo gurigii Rabbigana
waan keenay, oo waxaan soo geliyey qolladdii ilma Xaanaan
kaasoo ahaa ina Yigdalyaah oo ahaa nin Ilaah u go'ay,
taasoo ku dhinac tiil qolladdii amiirrada, oo ka sii korraysay
qolladdii Macaseeyaah ina Shalluum ee iridjooge ahaa. 5
Markaasaan wiilashii reer Reekaab soo hor dhigay weelal
khamri ka buuxo iyo koobab, oo waxaan ku idhi, Khamrigan
cabba. 6 Laakiinse waxay yidhaahdeen, Innaba khamri
cabbi mayno, waayo, awowgayo Yoonaadaab oo ahaa ina
Reekaab ayaa nagu amray oo nagu yidhi, Weligiin idinka iyo
wiilashiinnuba waa inaydaan khamri cabbin. 7 Oo innaba
guri ha dhisanina, abuurna ha daadinina, oo beercanabna
ha beeranina, hana yeelanina, laakiinse cimrigiinna oo dhan
waxaad degganaataan teendhooyin si aad wakhti dheer u
sii joogtaan dalka aad deggan tihiin. 8 Oo annagu waannu
addeecnay codkii awowgayo Yoonaadaab ina Reekaab oo
nagu amray inaannan innaba khamri cabbin cimrigayaga
oo dhan, annaga, iyo naagahayaga, iyo wiilashayada, iyo
gabdhahayaguba, 9 iyo inaannan guryo aan ku degnona
innaba dhisan, oo weliba annagu ma aannu lihin beercanab,
ama beer kale, amase abuurba, 10 laakiinse teendhooyin
baannu ku degganayn, oo waannu addeecnay, waanan
wada samaynay sidii awowgayo Yoonaadaab uu nagu amray
oo dhan. 11 Laakiinse markii Nebukadresar oo boqorka
Baabuloon ahu uu dalka yimid ayaannu isnidhi, Ina keena
aynu Yeruusaalem u guurnee, waana cabsida aannu ciidanka
reer Kaldayiin, iyo ciidanka reer Suuriya ka cabsannay
aawadeed, oo sidaas daraaddeed ayaannu Yeruusaalem ku
deggan nahay. 12 Markaasaa eraygii Rabbigu Yeremyaah
u yimid, isagoo leh, 13 Rabbiga ciidammada oo ah Ilaaha
reer binu Israa'iil wuxuu leeyahay, Tag, oo dadka Yahuudah
iyo kuwa Yeruusaalem degganba waxaad ku tidhaahdaa,
Rabbigu wuxuu leeyahay, War, tacliin miyeydaan qaadanayn
inaad erayadayda maqashaan? 14 Yoonaadaab ina Reekaab
erayadiisii uu wiilashiisa ku amray inayan innaba khamri
cabbin waa la wada oofiyey, oo ilaa maantadan la joogo
iyagu khamrina ma cabbaan, waayo, waxay addeecaan
amarkii awowgood, aniguse waan idinla hadlay, anigoo goor
wanaagsan idinla hadlaya, laakiinse innaba ima aydaan
dhegaysan. 15 Oo weliba waxaan idiin soo diray nebiyadii
addoommadayda ahaa anigoo goor wanaagsan idiin soo
diraya, oo idinku leh, Midkiin kastaaba haatan jidkiisa sharka
ah ha ka soo noqdo, oo falimihiinnana hagaajiya, oo ilaahyo
kale ha daba gelina inaad u adeegtaan aawadeed, oo
markaas waxaad iska degganaan doontaan dalkii aan
siiyey idinka iyo awowayaashiinba, laakiinse idinku dheg
iima aydaan dhigin, oo innaba ima aydaan dhegaysan. 16
Yoonaadaab ina Reekaab wiilashiisii way wada oofiyeen
amarkii awowgood uu iyaga ku amray, laakiinse dadkanu
aniga ima ay dhegaysan, 17 sidaas daraaddeed Rabbiga
ah Ilaaha ciidammada oo ah Ilaaha reer binu Israa'iil
wuxuu leeyahay, Bal ogaada, dadka Yahuudah iyo kuwa
Yeruusaalem deggan oo dhanba waxaan ku soo dejin doonaa
masiibadii aan iyaga kaga hadlay oo dhan, maxaa yeelay,
waan la hadlay, laakiinse ima dhegaysan, waanan u yeedhay,
laakiinse iima ay jawaabin. 18 Markaas Yeremyaah wuxuu
reer Reekaab ku yidhi, Rabbiga ciidammada oo ah Ilaaha reer

binu Israa'iil wuxuu leeyahay, Idinku waxaad addeecdeen
amarkii awowgiin Yoonaadaab, oo qaynuunnadiisii oo dhanna
waad dhawrteen, oo waxaad wada samayseen wixii uu
idinku amray oo dhan, **19** haddaba sidaas daraaddeed,
Rabbiga ciidammada oo ah Ilaaha reer binu Israa'iil wuxuu
leeyahay, Yoonaadaab ina Reekaab marnaba weligiis ma
waayi doono nin hortayda istaaga.

**36** Boqorkii dalka Yahuudah oo ahaa Yehooyaaqiim
ina Yoosiyaah sannaddiisii afraad ayaa erayganu
Yeremyaah uga yimid xagga Rabbiga, oo wuxuu ku yidhi, **2**
Kitaab duudduuban soo qaad, oo waxaad ku qortaa erayadii
aan wakhtigii Yoosiyaah iyo ilaa maantadan la joogo inta ka
dhex leh kugula hadlay oo dhan, kuwaas oo ka gees ahaa
dalka Israa'iil, iyo dalka Yahuudah, iyo quruumaha oo dhan.
**3** Waxaa suurtowda inay dadka Yahuudah maqli doonaan
masiibadii aan ula qasdiyey inaan iyaga ku sameeyo oo
dhan, si ninkood kastaaba uu jidkiisa sharka ah uga soo
noqdo, si aan xumaantooda iyo dembigoodaba uga cafiyo. **4**
Markaasaa Yeremyaah Baaruug ina Neeriiyaah u yeedhay,
oo Baaruugna wuxuu afkii Yeremyaah erayadii Rabbigu
isaga u sheegay oo dhan kaga qoray kitaab duudduuban. **5**
Markaasaa Yeremyaah amray Baaruug, oo wuxuu yidhi,
Anigu waan xidhnahay, oo guriga Rabbiga ma aan tegi
karo, **6** sidaas daraaddeed adigu tag, oo waxaad maalinta
soonka dadka dhegihiisa ku akhridaa erayadii Rabbiga
ee aad afkayga kitaabkii duudduubnaa kaga qortay, oo
waxaad ku akhridaa guriga Rabbiga dhexdiisa, oo weliba
waxaad kaloo dhegaha uga akhridaa dadka Yahuudah ee
magaalooyinkooda ka yimid oo dhan. **7** Waxaa suurtowda
inay baryootankooda Rabbiga hor keenaan, oo midkood
kastaaba uu jidkiisa sharka ah ka soo noqdo, waayo,
cadhada iyo xanaaqa uu Rabbigu dadkan kaga hadlay
way weyn yihiin. **8** Markaasaa Baaruug ina Neeriiyaah
wada sameeyey sidii Yeremyaah ku amray oo dhan, oo
wuxuu kitaabkii ka akhriyey erayadii Rabbiga isagoo gurigii
Rabbiga dhex jooga. **9** Boqorkii dalka Yahuudah oo ahaa
Yehooyaaqiim ina Yoosiyaah sannaddiisii shanaad bisheedii
sagaalaad waxaa dadkii Yeruusaalem degganaa oo dhan
iyo dadkii Yeruusaalem uga yimid magaalooyinka dalka
Yahuudah oo dhan loogu dhawaaqay inay Rabbiga hortiisa ku
soomaan. **10** Markaas Baaruug wuxuu kitaabkii ka akhriyey
erayadii Yeremyaah gurigii Rabbiga gudihiisa Gemaryaah
ina Shaafaan oo karraani ahaa qolladdiisii oo ku tiil barxadda
sare, oo u dhowayd meesha iridda cusub ee guriga Rabbiga
laga soo galo, oo wuxuu dhegaha u saaray dadkii oo dhan.
**11** Miikaayaah ina Gemaryaah oo ahaa ina Shaafaan markuu
kitaabkii ka maqlay erayadii Rabbiga oo dhan **12** ayuu
hoos u degtay oo wuxuu galay gurigii boqorka iyo qolladdii
karraaniga, oo bal eeg, amiirradii oo dhammu halkaasay
wada fadhiyeen, oo waxay ahaayeen Eliishaamaac oo
karraaniga ahaa, iyo Delaayaah ina Shemacyaah, iyo
Elnaataan ina Cakboor, iyo Gemaryaah ina Shaafaan, iyo
Sidqiyaah ina Xananyaah, iyo amiirradii oo dhan. **13** Markaas
Miikaayaah wuxuu iyagii u sheegay erayadii uu maqlay
oo dhan markii Baaruug uu kitaabka ku akhriyey dadka
dhegihiisa. **14** Sidaas daraaddeed amiirradii oo dhammu
waxay Baaruug u soo direen Yehuudii ina Netanyaah oo
ahaa ina Shelemyaah ina Kuushii, oo waxay ku yidhaahdeen,
Kitaabkii duudduubnaa oo aad dadka dhegihiisa ku akhriday
soo qaad oo noo kaalay. Markaasaa Baaruug ina Neeriiyaah
gacanta ku soo qaaday kitaabkii duudduubnaa, oo iyagii u
yimid. **15** Oo iyagiina waxay ku yidhaahdeen, Haddaba bal
fadhiiso oo dhegahayaga ku akhri, oo markaasuu Baaruug
kitaabkii dhegahoodii ku akhriyey. **16** Oo markay erayadii
oo dhan maqleen ayay baqeen oo midkoodba kii kaluu
fiiriyey, oo waxay Baaruug ku yidhaahdeen, Sida xaqiiqada
ah erayadan oo dhan boqorka waannu u sheegi doonnaa.
**17** Markaasay Baaruug weyddiiyeen oo ku yidhaahdeen,
Bal noo sheeg sidii aad erayadan oo dhan afkiisa uga
qortay? **18** Oo Baaruugna iyaguu u jawaabay, oo wuxuu
ku yidhi, Isagu erayadan oo dhan afkiisuu iiga sheegay,
oo aniguna khad baan kitaabkii ku qoray. **19** Markaas
amiirradii waxay Baaruug ku yidhaahdeen, Tag, oo adiga iyo
Yeremyaahba dhuunta, oo yaan ciduna ogaan meeshaad
joogtaan. **20** Markaasay boqorkii oo barxaddiisa jooga u
galeen, kitaabkii duudduubnaase waxay dhigeen qolladdii
Eliishaamaac oo karraanigii ahaa, oo erayadii oo dhanna
boqorkay u sheegeen. **21** Markaas boqorkii wuxuu Yehuudii
u diray inuu kitaabkii u keeno, oo isna wuxuu ka soo qaaday
Eliishaamaac oo karraanigii ahaa qolladdiisii. Markaas
Yehuudii wuxuu kitaabkii ku akhriyey dhegihii boqorka
iyo dhegihii amiirradii boqorka ag taagnaa oo dhan. **22**
Haddaba waxay ahayd bishii sagaalaad, oo boqorkuna
wuxuu fadhiyey gurigii qabowga laga geli jiray, oo hortiisana
waxaa yiil dab girgire ku dhex ololaya. **23** Oo haddaba markii
Yehuudii saddex amase afar qaybood akhriyey ayaa boqorku
mandiil ku gooyay, oo wuxuu ku dhex tuuray dabkii girgiraha
ka baxayay, ilamaa kitaabkii duudduubnaa uu ku wada
baabba'ay dabkii girgiraha ka baxayay. **24** Oo boqorkii iyo
addoommadiisii erayadaas oo dhan maqlay midkoodna ma
cabsan, oo dharkoodiina ma ay jeexjeexin. **25** In kastoo ay
Elnaataan iyo Delaayaah iyo Gemaryaah boqorkii ka baryeen
inuusan kitaabka duudduuban gubin wuu maqli waayay.

26 Markaas boqorkii wuxuu Yeraxme'eel ina Hammeleg,
iyo Seraayaah ina Casrii'eel, iyo Shelemyaah ina Cabdeel
ku amray inay karraanigii Baaruug iyo Nebi Yeremyaahba
soo qabtaan, laakiinse Rabbigaa qariyey. 27 Oo haddana
Eraygii Rabbiga ayaa Yeremyaah u yimid markuu boqorku
kitaabkii duudduubnaa iyo erayadii uu Baaruug ka qoray
afka Yeremyaah gubay dabadeed, oo wuxuu ku yidhi, 28
Haddana kitaab kale oo duudduuban soo qaad, oo waxaad
ku qortaa erayadii kitaabkii duudduubnaa ee hore ku yiil oo
dhan, kaasoo Yehooyaaqiim oo ah boqorka dalka Yahuudah
uu gubay. 29 Oo boqorka dalka Yahuudah oo Yehooyaaqiim
ahna waxaad ku tidhaahdaa, Rabbigu wuxuu leeyahay,
Waxaad gubtay kitaabkii duudduubnaa, adigoo leh, Maxaad
gudihiisa waxyaalahan ugu qortay, oo aad u tidhi, Sida
xaqiiqada ah boqorka Baabuloon wuu iman doonaa oo
dalkanna wuu baabbi'in doonaa, halkanna dad iyo duunyoba
wuu ka gooyn doonaa? 30 Sidaas daraaddeed Rabbigu
wuxuu Yehooyaaqiim oo ah boqorka dalka Yahuudah ka
leeyahay, Isagu ma uu yeelan doono mid carshigii Daa'uud
ugu fadhiista, oo meydkiisa waxaa maalintii loo xoori doonaa
kulaylka, habeenkiina sayaxa barafoobay. 31 Oo isaga iyo
farcankiisa iyo addoommadiisaba xumaantooda aawadeed
ayaan u ciqaabi doonaa, oo iyaga, iyo dadka Yeruusaalem
deggan, iyo dadka dalka Yahuudahba waxaan ku soo dejin
doonaa masiibadii aan iyaga kaga hadlay oo dhan, laakiinse
way maqli waayeen. 32 Markaas Yeremyaah wuxuu soo
qaaday kitaab kale oo duudduuban, oo wuxuu u dhiibay
karraanigii ahaa Baaruug ina Neeriiyaah, oo isna wuxuu afka
Yeremyaah ka qoray erayadii ku yiil kitaabkii Yehooyaaqiim
oo boqorka dalka Yahuudah ahu uu dabka ku gubay oo
dhan, oo weliba waxaa iyagii lagu sii daray erayo kale oo
badan oo iyagii la mid ah.

**37** Oo Boqor Sidqiyaah oo ahaa ina Yoosiyaah ayaa
boqor ka noqday meeshii Konyaah ina Yehooyaaqiim,
kaasoo ahaa kii Nebukadresar oo ahaa boqorkii Baabuloon
uu isaga boqor uga dhigay dalkii Yahuudah. 2 Laakiinse
isagii, iyo addoommadiisii, iyo dadkii dalka toona midkoodna
ma maqlin erayadii Rabbiga ee uu isagu kaga hadlay Nebi
Yeremyaah. 3 Oo Boqor Sidqiyaah wuxuu Nebi Yeremyaah
u soo diray Yehuukal ina Shelemyaah, iyo Sefanyaah ina
wadaadka Macaseeyaah, oo wuxuu ku soo yidhi, Bal Rabbiga
Ilaaheenna ah noo bari. 4 Oo markaas Nebi Yeremyaah
dadka dhexdiisa ayuu gudaha u soo geli jiray oo dibadda
uga bixi jiray, waayo, weli ma ay xabbisin. 5 Oo ciidankii
Fircoon ayaa Masar ka soo baxay, oo reer Kaldayiinkii
Yeruusaalem ku hareeraysnaana markay warkoodii maqleen
ayay Yeruusaalem ka kala tageen. 6 Markaasaa eraygii
Rabbigu Nebi Yeremyaah u yimid, oo wuxuu ku yidhi, 7
Rabbiga ah Ilaaha reer binu Israa'iil wuxuu leeyahay, Boqorka
dalka Yahuudah oo ii soo kiin diray inuu wax i weyddiisto
waxaad ku tidhaahdaan, Bal eeg, ciidanka Fircoon oo u soo
baxay inuu ku caawiyo, waxay ku noqon doonaan dalkoodii
Masar. 8 Oo reer Kaldayiinna way soo noqon doonaan, oo
magaaladan bay la diriri doonaan, wayna qabsan doonaan,
oo dab bay ku gubi doonaan. 9 Rabbigu wuxuu leeyahay,
Idinku ha iskhiyaanaynina, oo ha isku odhanina, Hubaal
reer Kaldayiin way naga tegayaan, maxaa yeelay, iyagu ma
ay tegi doonaan. 10 Waayo, in kastoo aad ciidanka reer
Kaldayiin ee idinla diriraya wada baabbi'in lahaydeen, oo
rag dhaawac ah mooyaane aan iyaga wax kale ka hadhin,
haddana iyaga midkood kastaaba wuxuu ka soo kici lahaa
teendhadiisa, oo dab bay magaaladan ku gubi lahaayeen.
11 Oo markii ciidankii reer Kaldayiin ay Yeruusaalem uga
kala tageen cabsi ay ka qabaan ciidankii Fircoon aawadiis
12 ayaa Yeremyaah Yeruusaalem ka baxay oo wuxuu galay
dalkii reer Benyaamiin si uu meeshaas qaybtiisa dadka uga
dhex helo. 13 Oo markuu iriddii reer Benyaamiin joogay
waxaa isna halkaas joogay sirkaal waardiyayaasha madax u
ahaa, oo magiciisa la odhan jiray Yiriyaah ina Shelemyaah,
oo ahaa ina Xananyaah, oo isna Yeremyaah buu qabtay oo
wuxuu ku yidhi, Adigu waxaad u gelaysaa reer Kaldayiin.
14 Markaas Yeremyaah wuxuu ku yidhi, Taasu waa been,
anigu reer Kaldayiin u geli maayo. Laakiinse isagu innaba
ma uu dhegaysan, sidaas daraaddeed Yiriyaah wuxuu soo
qabtay Yeremyaah, oo amiirradii u keenay. 15 Amiirradiina
Yeremyaah bay u cadhoodeen, oo intay garaaceen ayay
gurigii Yoonaataan oo karraanigii ahaa ku xabbiseen, waayo,
kaasay xabsi ka dhigeen. 16 Markii Yeremyaah uu gurigii
godka ahaa galay iyo weliba qolalkii hoose, oo uu halkaas
maalmo badan ku jiray, 17 ayaa waxaa isagii u soo cid
diray Boqor Sidqiyaah, oo soo bixiyey. Markaasaa boqorkii
si qarsoodi ah gurigiisa gudihiisa wax ugu weyddiiyey,
oo wuxuu ku yidhi, Eray Rabbiga ka yimid miyuu jiraa?
Kolkaasaa Yeremyaah ku yidhi, Waa jiraa. Oo wuxuu kaloo
yidhi, Adigu waxaa laguu gelin doonaa gacanta boqorka
Baabuloon. 18 Oo weliba Yeremyaah wuxuu Boqor Sidqiyaah
ku yidhi, Bal maxaan adiga, amase addoommadaada, amase
dadkan u dhimay, oo aad ii xabbisteen? 19 Haddaba bal
meeye nebiyadaadii wax idiin sii sheegay, oo idinku yidhi,
Boqorka Baabuloon ku soo duuli maayo idinka iyo dalkanba?
20 Haddaba boqorow, sayidkaygiiyow, bal baryadayda maqal,
oo waan ku baryayaaye baryootankayga xaggaaga ha
laga aqbalo, oo gurigii karraaniga Yoonaataan ha igu celin,

waaba intaasoo aan halkaas ku dhintaaye. 21 Markaas
Boqor Sidqiyaah wuxuu ku amray in Yeremyaah barxaddii
waardiyayaasha lagu daayo, oo waxaa dharaar kasta jidka
kibisdubayaasha laga siin jiray xabbad kibis ah, ilamaa kibistii
magaaladu ay wada dhammaatay. Oo sidaasuu Yeremyaah
barxaddii waardiyayaasha ugu sii hadhay.

**38** Shefatyaah ina Mataan, iyo Gedalyaah ina Fashxuur,
iyo Yuukal ina Shelemyaah, iyo Fashxuur ina Malkiiyaah
waxay maqleen erayadii Yeremyaah ee uu dadka oo dhan
kula hadlay, isagoo leh, 2 Rabbigu wuxuu leeyahay, Kii
magaaladan sii joogaaba wuxuu ku dhiman doonaa seef, iyo
abaar, iyo belaayo, laakiinse kii reer Kaldayiin u baxaa wuu
noolaan doonaa, oo naftiisuna waxay isaga u ahaan doontaa
sidii booli oo kale, wuuna noolaan doonaa. 3 Rabbigu
wuxuu leeyahay, Sida xaqiiqada ah magaaladan waxaa loo
gacangelin doonaa ciidanka boqorka Baabuloon, oo isna
wuu qabsan doonaa. 4 Markaas amiirradii waxay boqorkii ku
yidhaahdeen, Waannu ku baryaynaaye, Ninkan ha la dilo,
waayo, erayadan uu iyaga kula hadlayo aawadood ayuu
ku daciifinayaa gacmihii ragga dagaalka ee magaaladan
ku hadhay iyo gacmihii dadka kale oo dhanba, waayo,
isagu dadkan waxyeelladiisa mooyaane wanaaggiisa dooni
maayo. 5 Markaasaa Boqor Sidqiyaah yidhi, Bal eega,
isagu gacantiinnuu ku jiraa, waayo, boqorku innaba ma
aha mid wax idinka gees ah samayn kara. 6 Markaasay
Yeremyaah soo qabteen oo ku dhex rideen godkii Malkiiyaah
ina Hammeleg, ee barxadda waardiyayaasha ku dhex yiil, oo
Yeremyaah xadhkay ku dejiyeen, oo godkiina biyo kuma jirin,
laakiinse waxaa ka buuxday dhoobo, sidaas daraaddeed
Yeremyaah dhoobaduu ku dhex tiimbaday. 7 Haddaba
Cebedmeleg oo ahaa reer Itoobiya oo ahaa bohon guriga
boqorka joogay, markuu maqlay inay Yeremyaah godkii ku
dhex rideen, iyadoo boqorkii uu iridda Benyaamiin fadhiyo, 8
ayuu gurigii boqorka ka soo baxay, oo boqorkuu la hadlay,
isagoo ku leh, 9 Boqorow, sayidkaygiiyow, nimankanu si
xun bay u sameeyeen wax alla wixii ay ku sameeyeen
Nebi Yeremyaah, kaasoo ay godkii ku dhex rideen, oo
waxaa suurtowda inuu abaarta ugu bakhtiyo meeshuu
ku jiro, waayo, innaba magaalada kibisu kuma jirto. 10
Markaasaa boqorkii wuxuu amray Cebedmeleg oo reer
Itoobiya ahaa, isagoo ku leh, Halkan soddon nin ka kaxayso
oo Nebi Yeremyaah godka ka soo bixi intuusan dhiman. 11
Sidaas daraaddeed ayaa Cebedmeleg raggii kaxaystay, oo
gurigii boqorka galay, oo wuxuu tegey meel khasnadda ka
hoosaysay, oo halkaasuu ka qaaday calallo haylamo ah iyo
dhar duugoobay, oo intuu xadhko ku xidhay ayuu Yeremyaah
godkii ugu dejiyey. 12 Markaas Cebedmeleg oo reer Itoobiya
ahaa wuxuu Yeremyaah ku yidhi, Calalladan haylamaha ah
iyo dharkan duugoobay kilkilooyinka kaga xidho xadhkaha
hoostooda, oo Yeremyaahna saasuu yeelay. 13 Markaasay
Yeremyaah xadhkihii ku soo jiideen oo godkii bay kor uga
soo bixiyeen, oo Yeremyaahna wuxuu ku hadhay barxaddii
waardiyayaasha. 14 Markaasaa Boqor Sidqiyaah u soo cid
diray oo kaxaystay Nebi Yeremyaah, oo wuxuu gaystay
iriddii saddexaad ee guriga Rabbiga. Kolkaas boqorkii
wuxuu Yeremyaah ku yidhi, Wax baan ku weyddiinayaaye,
inna waxba ha iga qarinin. 15 Markaas Yeremyaah wuxuu
Sidqiyaah ku yidhi, Haddaan kuu sheego, hubaal miyaadan
i dili doonin? Oo haddaan kula taliyona innaba ima maqli
doontid. 16 Markaas Boqor Sidqiyaah si qarsoodi ah ayuu
Yeremyaah ugu dhaartay, oo wuxuu ku yidhi, Rabbiga nool ee
naf ina siiyey ayaan ku dhaaranayaa inaanan ku dili doonin,
ama aanan gacanta raggan naftaada doondoonaya kugu ridi
doonin. 17 Markaas Yeremyaah wuxuu Sidqiyaah ku yidhi,
Rabbiga ah Ilaaha ciidammada oo ah Ilaaha reer binu Israa'iil
wuxuu leeyahay, Haddaad amiirrada boqorka Baabuloon u
baxdid, naftaada iyo reerkaaguba way noolaan doonaan,
oo magaaladanna dab laguma gubi doono, 18 laakiinse
haddaadan amiirrada boqorka Baabuloon u bixin, markaas
magaaladan waxaa lagu ridi doonaa gacanta reer Kaldayiin,
oo dab bay ku gubi doonaan, adiguna gacantooda kama
baxsan doontid. 19 Markaas Sidqiyaah wuxuu Yeremyaah
ku yidhi, Waxaan ka cabsanayaa Yuhuuddii reer Kaldayiin
u gashay waaba intaasoo ay gacantooda i geliyaan oo ay
iyana igu majaajiloodaan. 20 Laakiinse Yeremyaah wuxuu
ku yidhi, Iyagu kuma ay gacangelin doonaan. Waan ku
baryayaaye addeec codka Rabbiga ee aan kugula hadlay,
waanad nabdoonaan doontaa oo naftaaduna way sii noolaan
doontaa. 21 Laakiinse haddaad diiddo inaad baxdo, kanu waa
eraygii Rabbigu i tusay, 22 Bal ogow, naagaha guriga boqorka
dalka Yahuudah ku hadhay dhammaantood waxaa loo bixin
doonaa amiirrada boqorka Baabuloon, oo naagahaasi waxay
odhan doonaan, Saaxiibbadaa ayaa ku khiyaaneeyey oo
way kaa adkaadeen oo haddana cagahaagii waxay ku dhex
tiimbadeen dhoobada, oo iyana dib bay kaaga noqdeen.
23 Markaasay naagahaaga oo dhan iyo carruurtaadaba
reer Kaldayiin u bixin doonaan, oo adiguna gacantooda
sina ugama baxsan doontid, laakiinse waxaa ku qabsan
doonta gacanta boqorka Baabuloon, oo magaaladanna
dab baa lagu gubi doonaa. 24 Markaas Sidqiyaah wuxuu
Yeremyaah ku yidhi, Ninna yuusan erayadan ogaanin, oo
adiguna dhiman maysid. 25 Laakiinse hadday amiirradu
maqlaan inaan kula hadlay, oo ay kuu yimaadaan oo ay

kugu yidhaahdaan, Wixii aad boqorka ku tidhi noo sheeg, oo
weliba wixii boqorku kugu yidhi ha naga qarin, oo annana
ku dili mayno, **26** markaas waxaad iyaga ku tidhaahdaa,
Baryootankaygii ayaan boqorka hor dhigay, inuusan gurigii
Yoonaataan igu celin, oo aanan halkaas ugu dhiman. **27**
Markaasay amiirradii oo dhammu Yeremyaah u yimaadeen
oo wax bay weyddiiyeen, oo isna wuxuu u wada sheegay
erayadii boqorku ku amray oo dhan. Markaasay lahadliddiisii
iska daayeen, waayo, xaalkaas ciduna ma maqlin. **28** Oo
Yeremyaah wuxuu joogay barxaddii waardiyayaasha ilaa
maalintii Yeruusaalem la qabsaday.

**39** Sidqiyaah oo ahaa boqorkii dalka Yahuudah
sannaddiisii sagaalaad, bisheedii tobnaad ayay
Nebukadresar oo ahaa boqorkii Baabuloon iyo ciidankiisii oo
dhammu Yeruusaalem ku keceen, wayna hareereeyeen, **2**
Boqor Sidqiyaah sannaddiisii kow iyo tobnaad, bisheedii
afraad, maalinteedii sagaalaad ayaa meel magaalada ahayd
la jebiyey, **3** markaas Yeruusaalem waa la qabtay oo amiirradii
boqorka Baabuloon oo dhammu intay galeen ayay iriddii
dhexe fadhiisteen, oo waxay ahaayeen Neergal Shareser, iyo
Samgar Nebuu, iyo Sarsekiim, iyo Rab Saariis, iyo Neergal
Shareser, iyo Rab Maag iyo intii kale ee saraakiishii boqorka
Baabuloon oo dhan. **4** Oo Sidqiyaah oo ahaa boqorkii
dalka Yahuudah iyo raggii dagaalka oo dhammuba markay
iyagii arkeen ayay carareen, oo waxay goor habeennimo ah
magaaladii kaga bexeen jidkii beerta boqorka ee u dhowaa
iriddii labada derbi u dhaxaysay, oo isna wuxuu maray jidkii
Caraabaah. **5** Laakiinse ciidankii reer Kaldayiin ayaa iyagii
eryaday, oo waxay Sidqiyaah ku gaadheen bannaannadii
Yerixoo, oo markay qabsadeen ayay Nebukadresar oo ahaa
boqorkii Baabuloon ugu geeyeen Riblaah oo ku tiil dalka
Xamaad, wuuna xukumay. **6** Markaasaa boqorkii Baabuloon
Sidqiyaah wiilashiisii Riblaah ku laayay aabbahood oo
arkaya, oo weliba boqorkii Baabuloon wuxuu kaloo laayay
kuwii gobta ahaa ee dalka Yahuudah oo dhan. **7** Oo
weliba Sidqiyaahna indhihii buu ka riday, oo silsilado ku
xidhxidhay si uu Baabuloon ugu kaxaysto. **8** Markaasay
reer Kaldayiin dab ku gubeen gurigii boqorka iyo guryihii
dadkaba, oo derbiyadii Yeruusaalemna way wada dumiyeen.
**9** Markaasaa Nebuusaradaan oo ahaa sirkaalkii askarta
wuxuu Baabuloon maxaabiis ahaan ugu kaxaystay dadkii
magaalada ku hadhay, iyo kuwii cararay ee isaga u galay, iyo
dadka intiisii kale ee hadhayba. **10** Laakiinse Nebuusaradaan
oo sirkaalkii askarta ahaa wuxuu dalka Yahuudah kaga
tegey dadkii waddanka ugu liitay oo aan waxba haysan,
oo wuxuu isla markaasba iyagii siiyey beero canab ah, iyo
beero kaleba. **11** Haddaba Nebukadresar oo ahaa boqorkii
Baabuloon wuxuu Nebuusaradaan oo ahaa sirkaalkii askarta
siiyey amar ku saabsan Yeremyaah, oo wuxuu isagii ku
yidhi, **12** Isaga kaxee, oo si wanaagsan u ilaali, oo innaba
waxba ha yeelin, laakiinse waxaad u samaysaa wax alla wixii
uu ku yidhaahdo. **13** Sidaas daraaddeed Nebuusaradaan oo
ahaa sirkaalkii askarta iyo Nebuushasbaan, iyo Rab Saariis,
iyo Neergal Shareser, iyo Rab Maag, iyo saraakiishii sare
oo boqorka Baabuloon oo dhammuba **14** waxay u soo cid
direen Yeremyaah, oo intay barxaddii waardiyayaasha ka soo
bixiyeen ayay u dhiibeen Gedalyaah ina Ahiiqaam oo ahaa
ina Shaafaan inuu gurigiisa u kaxeeyo, markaasuu dadka
dhexdiisa joogay. **15** Haddaba eraygii Rabbigu wuxuu u yimid
Yeremyaah intuu ku xidhnaa barxaddii waardiyayaasha,
isagoo leh, **16** Tag, oo Cebedmeleg kan reer Itoobiya la
hadal, oo waxaad ku tidhaahdaa, Rabbiga ciidammada
oo ah Ilaaha reer binu Israa'iil wuxuu leeyahay, Bal ogow,
erayadayda ayaan magaaladan ugu soo dejin doonaa inaan
masiibo u keeno, ee mana ahaa wanaag, oo maalintaasay
hortaada ku dhici doonaan. **17** Laakiinse maalintaas waan ku
samatabbixin doonaa, ayaa Rabbigu leeyahay, oo laguma
gelin doono gacanta dadka aad ka baqaysid. **18** Waayo,
hubaal waan ku badbaadin doonaa, oo innaba seef kuma
aad dhiman doontid, laakiinse naftaadu waxay kuu ahaan
doontaa sida booli oo kale, maxaa yeelay, waad isku kay
hallaysay, ayaa Rabbigu leeyahay.

**40** Kanu waa eraygii Yeremyaah xagga Rabbiga uga yimid
markii Nebuusaradaan oo sirkaalkii waardiyayaasha
ahaa uu Yeremyaah oo silsilado ku xidhan iyo dadka
Yeruusaalem iyo kuwa dalka Yahuudah maxaabiis ahaan
Baabuloon ugu kaxaynayay oo uu Yeremyaah Raamaah ku
sii daayay. **2** Sirkaalkii waardiyayaashu Yeremyaah ayuu soo
kexeeyey, oo wuxuu ku yidhi, Rabbiga Ilaahaaga ah ayaa
masiibadan meeshan kaga hadlay. **3** Haddaba Rabbigu
wuu dejiyey, oo wuxuu u sameeyey siduu ku hadlay, maxaa
yeelay, Rabbigaad ku dembaabteen, oo codkiisiina ma
aydaan addeecin, oo sidaas daraaddeed ayaa waxanu idiinku
dheceen. **4** Haddaba bal eeg, maanta silsiladihii gacanta
kaaga xidhnaa waan kaa furay. Hadday kula wanaagsan
tahay inaad Baabuloon ii raacdid, kaalay oo aniguna si
wanaagsan baan kuu dhaqaalayn doonaa, laakiinse hadday
kula xun tahay inaad Baabuloon ii raacdid, iska dhaaf. Bal
eeg, dalkii oo dhammu adiguu ku hor yaal. Haddaba meel alla
meeshii kula wanaagsan ee kula habboon inaad tagtid, tag.
**5** Oo weliba intuusan dib u noqonin ayuu ku yidhi, Waxaad
ku noqotaa Gedalyaah ina Ahiiqaam oo ahaa ina Shaafaan

oo boqorkii Baabuloon uu taliye uga dhigay magaalooyinkii
dalka Yahuudah, oo isaga la joog dadka dhexdiisa, amase
waxaad tagtaa meel alla meeshii kula habboon inaad
tagtid. Markaas sirkaalkii waardiyayaashu wuxuu isagii siiyey
sahay iyo hadiyad, kolkaasuu iska sii daayay. **6** Markaas
Yeremyaah wuxuu Gedalyaah ina Ahiiqaam ugu tegey
Misfaah, oo isaguu la dhex degay dadkii dalka ku hadhay.
**7** Oo saraakiishii ciidammadii duurka ku jiray oo dhan iyo
raggoodiiba markay maqleen in boqorkii Baabuloon uu dalkii
taliye uga dhigay Gedalyaah ina Ahiiqaam, oo uu isagii
u dhiibay rag, iyo naago, iyo carruurba, kuwaasoo ahaa
masaakiintii dalka ku hadhay oo aan Baabuloon maxaabiis
ahaan loogu kaxaysan, **8** ayay Gedalyaah ugu yimaadeen
Misfaah, waxayna ahaayeen Ismaaciil ina Netanyaah, iyo
Yooxaanaan iyo Yoonaataan oo ahaa ilma Qaaree'ax, iyo
Seraayaah ina Tanxumed, iyo ilma Ceefay oo ahaa reer
Netofaah iyo Yesanyaah oo ahaa wiilkii kii reer Macakaah,
iyagii iyo raggoodii oo dhammuba. **9** Markaasaa Gedalyaah
ina Ahiiqaam oo ahaa ina Shaafaan wuxuu dhaar u maray
iyagii iyo raggoodiiba, oo wuxuu ku yidhi, Ha ka cabsanina
inaad reer Kaldayiin u adeegtaan. Haddaba dalka iska
degganaada, oo boqorka Baabuloon u adeega, oo idinna
waad nabdoonaan doontaan. **10** Aniguna waxaan degganaan
doonaa Misfaah, si aan ugu joogo reer Kaldayiinka hadba noo
imanaya, idinkuse waxaad urursataan khamri, iyo midhaha
beergoosadka, iyo saliid, oo weelashiinna ku shubta, oo
waxaad degganaataan magaalooyinkii aad qabsateen. **11**
Sidaas oo kalena Yuhuuddii reer Moo'aab, iyo reer Cammoon,
iyo reer Edom dhex joogtay oo dhan, iyo kuwii dalalka kale
joogay oo dhammuba markay maqleen in boqorkii Baabuloon
uu qaar kaga tegey dalkii Yahuudah iyo inuu iyagii madax
uga dhigay Gedalyaah ina Ahiiqaam oo ahaa ina Shaafaan
**12** ayay Yuhuuddii oo dhammu ka soo wada noqdeen
meelihii loo kala eryay oo dhan, oo waxay yimaadeen dalkii
Yahuudah, oo Gedalyaah bay ugu yimaadeen Misfaah,
markaasay soo ururiyeen khamri iyo midhaha beergoosadka
oo fara badan. **13** Oo weliba Yooxaanaan ina Qaaree'ax
iyo saraakiishii ciidammadii duurka ku jiray oo dhammuba
waxay Gedalyaah ugu yimaadeen Misfaah **14** oo waxay ku
yidhaahdeen, Ma og tahay in Bacaliis oo ah boqorka reer
Cammoon uu Ismaaciil ina Netanyaah u soo diray inuu ku
dilo? Laakiinse Gedalyaah ina Ahiiqaam ma uu rumaysan.
**15** Markaasaa Yooxaanaan ina Qaaree'ax si qarsoodi ah
Gedalyaah ugula hadlay Misfaah, oo wuxuu ku yidhi, Waan
ku baryayaaye inaan tago ii fasax, Ismaaciil ina Netanyaah
aan soo dilee oo ciduna ma ogaan doonto. Bal muxuu kuu
dilayaa oo ay Yuhuuddii kugu soo wada ururtay oo dhammu
u kala firdhaan, oo intii dadka dalka Yahuudah ka hadhayna
ay u dhintaan? **16** Laakiinse Gedalyaah ina Ahiiqaam wuxuu
Yooxaanaan ina Qaaree'ax ku yidhi, Adigu waxan waa
inaadan innaba samayn, waayo, been baad Ismaaciil ka
sheegaysaa.

**41** Haddaba bishii toddobaad waxaa yimid Ismaaciil ina
Netanyaah oo ahaa ina Eliishaamaac, oo ka mid ahaa
farcankii boqornimada iyo weliba saraakiishii boqorka, isagoo
toban nin wata, oo waxay Gedalyaah ina Ahiiqaam ugu
yimaadeen Misfaah, oo halkaasay kibis ku wada cuneen. **2**
Markaasaa waxaa sara joogsaday Ismaaciil ina Netanyaah
iyo tobankii nin ee isaga la socday, oo Gedalyaah ina
Ahiiqaam oo ahaa ina Shaafaan ayay seef la dheceen oo
isagay dileen kaasoo boqorkii Baabuloon uu dalka taliye uga
dhigay. **3** Oo weliba Ismaaciil wuxuu kaloo wada laayay
Yuhuuddii Gedalyaah Misfaah la joogtay, iyo reer Kaldayiinkii
halkaas laga helay, kuwaasoo ahaa raggii dagaalka oo
dhan. **4** Oo maalintii uu Gedalyaah dilay maalintii ku
laba ahayd iyadoo aan ciduna weli ogayn **5** ayaa nimani
waxay ka yimaadeen Shekem iyo Shiiloh iyo Samaariya, oo
waxay ahaayeen siddeetan nin oo gadhadhkii iska xiiray,
oo dharkoodiina jeexjeexay, oo jidhkoodii googooyay, oo
gacmaha ku sida qurbaanno iyo foox ay guriga Rabbiga
u wadaan. **6** Oo Ismaaciil ina Netanyaah wuxuu Misfaah
uga tegey inuu iyaga ka hor tago aawadeed, isagoo ooyaya
intuu sii socday oo dhan, oo markuu iyagii la kulmay
wuxuu ku yidhi, Gedalyaah ina Ahiiqaam u kaalaya. **7** Oo
markay magaalada dhexdeedii yimaadeen ayaa Ismaaciil
ina Netanyaah kulligood wada laayay, oo isagii iyo raggii la
socday meydkoodii god bay ku rideen. **8** Laakiinse waxaa
dhexdoodii laga helay toban nin oo Ismaaciil ku tidhi, Ha na
dilin, waayo, annagu waxaannu leennahay kayd sarreen iyo
shaciir iyo saliid iyo malab ah oo duurka ku dhex qarsoon,
sidaas daraaddeed iyagii wuu iska dhaafay oo walaalahood
lama uu layn. **9** Haddaba godkii uu Ismaaciil ku riday raggii
uu Gedalyaah la laayay meydadkoodii oo dhan wuxuu ahaa
kii uu Boqor Aasaa u samaystay cabsi uu ka qabay boqorkii
dalka Israa'iil oo Bacshaa ahaa aawadeed, oo Ismaaciil ina
Netanyaah wuxuu godkaas ka buuxiyey kuwii uu laayay
meydkoodii. **10** Markaasaa Ismaaciil wuxuu maxaabiis
ahaan u kaxaystay dadka hadhay oo dhan, xataa gabdhihii
boqorka iyo dadkii Misfaah ku hadhay oo dhan, kuwaasoo
Nebuusaradaan oo ahaa sirkaalkii waardiyayaashu uu u
dhiibay Gedalyaah ina Ahiiqaam. Ismaaciil ina Netanyaah
maxaabiis ahaan ayuu u kaxaystay, oo wuxuu u ambabbaxay
inuu reer Cammoon u gudbo. **11** Laakiinse Yooxaanaan ina

Qaaree'ax iyo saraakiishii ciidammada ee isaga la joogtay
oo dhammu markay maqleen xumaantii uu Ismaaciil ina
Netanyaah sameeyey oo dhan 12 ayay kaxaysteen raggii oo
dhan, oo waxay u keceen inay Ismaaciil ina Netanyaah la
diriraan, oo isagay ka ag heleen biyihii badnaa ee Gibecoon
ku yaal. 13 Oo dadkii Ismaaciil ina Netanyaah watay oo
dhammu markay arkeen Yooxaanaan ina Qaaree'ax iyo
saraakiishii ciidammada oo isaga la jiray oo dhan ayay
wada farxeen. 14 Sidaas daraaddeed dadkii Ismaaciil uu
Misfaah maxaabbiisahaanta uga kaxaystay oo dhammu
intay jeesteen ayay dib u noqdeen, oo waxay u tageen
Yooxaanaan ina Qaaree'ax. 15 Laakiinse Ismaaciil ina
Netanyaah Yooxaanaan wuu ka baxsaday, oo intuu siddeed
nin la cararay ayuu reer Cammoon u tegey. 16 Markaasaa
Yooxaanaan ina Qaaree'ax iyo saraakiishii ciidammada ee
isaga la jirtay oo dhammu waxay soo kexeeyeen dadkii
hadhay ee uu dhammaan ka soo caymiyey Ismaaciil ina
Netanyaah markuu Misfaah ku dilay Gedalyaah ina Ahiiqaam
dabadeed, oo kuwaasu waxay ahaayeen raggii dagaalka, iyo
naagihii, iyo carruurtii, iyo bohommadii ee uu ka soo celiyey
Gibecoon. 17 Oo iyana intay tageen ayay Geeruud Kimhaam
oo Beytlaxam ku ag yiil degeen, si ay u tagaan oo ay Masar
u galaan reer Kaldayiin aawadood, 18 maxaa yeelay, iyagay
ka cabsanayeen, waayo, Ismaaciil ina Netanyaah ayaa dilay
Gedalyaah ina Ahiiqaam oo boqorkii Baabuloon uu dalka
taliye uga dhigay.

**42** Markaasaa saraakiishii ciidammada, iyo Yooxaanaan
ina Qaaree'ax, iyo Yesanyaah ina Hooshacyaah,
iyo dadkii oo dhan, kii ugu yaraa ilaa kii ugu weynaa,
way soo dhowaadeen, 2 oo waxay Nebi Yeremyaah ku
yidhaahdeen, Waannu ku baryaynaaye, baryootankayagu ha
ahaado mid hortaada lagu aqbalo, oo waxaad noo baridaa
Rabbiga Ilaahaaga ah, annagoo ah kuwan hadhay oo dhan,
waayo, kuwayagan yar ayaa ka hadhay dadkii badnaa, sida
aad adiguba indhahaaga noogu aragtid. 3 Noo ducee si
Rabbiga Ilaahaaga ahu uu noo tuso jidkii aannu ku socon
lahayn iyo wixii aannu samayn lahayn. 4 Markaasaa Nebi
Yeremyaah wuxuu iyagii ku yidhi, Waan idin maqlay, oo bal
eega, Rabbiga Ilaahiinna ah sidii ay erayadiinnu ahaayeen
ayaan u baryayaa, oo wax alla wixii Rabbigu idiinku soo
jawaaboba waan idiin sheegayaa, oo waxba dib idiinka
ceshan maayo. 5 Markaasay Yeremyaah ku yidhaahdeen,
Rabbigu dhexdeenna ha ku ahaado markhaati run iyo
daacad ah, haddaannan wada samayn waxyaalihii Rabbiga
Ilaahaaga ahu uu noogu soo kaa dhiibo oo dhan. 6 Hadduu
wanaag yahay iyo hadduu shar yahayba, annagu waannu
addeeci doonnaa codka Rabbiga Ilaahayaga ah, kaasoo
aannu kuu dirnay, si aannu u nabdoonaanno aawadeed
markaannu addeecno codka Rabbiga Ilaahayaga ah. 7 Oo
toban maalmood dabadeed ayaa eraygii Rabbigu Yeremyaah
u yimid. 8 Markaasuu u yeedhay Yooxaanaan ina Qaaree'ax,
iyo saraakiishii ciidammada ee isaga la joogtay oo dhan, iyo
dadkii oo dhan xataa kii ugu yaraa ilaa kii ugu weynaa, 9 oo
wuxuu iyagii ku yidhi, Rabbiga ah Ilaaha reer binu Israa'iil
oo aad iigu dirteen inaan baryootankiinna hortiisa geeyo
wuxuu leeyahay, 10 Haddaad dalkan sii joogtaan, waan idin
dhisi doonaa, oo idinma dumin doono, oo waan idin beeri
doonaa, oo idinma rujin doono innaba, waayo, waan ka
qoomamooday masiibadii aan idinku sameeyey. 11 Boqorka
Baabuloon oo aad ka baqaysaan ha ka cabsanina. Rabbigu
wuxuu leeyahay, Innaba isaga ha ka cabsanina, waayo,
anigaa idinla jira inaan idin badbaadiyo oo aan gacantiisa
idinka samatabbixiyo. 12 Waanan idiin naxariisan doonaa
si uu isagu idiinku naxariisto, oo uu dalkiinnii idiinku soo
celiyo. 13 Laakiinse haddaad tidhaahdaan, Annagu dalkan
degganaan mayno, oo codka Rabbiga Ilaahaaga ahna
addeeci mayno, 14 oo aad tidhaahdaan, Maya, laakiinse
waxaannu tegaynaa dalka Masar, halkaasoo aannan dagaal
arki doonin, amase aannan buunka dhawaaqiisa maqli
doonin, oo aannan innaba kibis u gaajoon doonin, oo
halkaasaannu degganaan doonnaa, 15 haddaba sidaas
daraaddeed, kuwiinna dadka Yahuudah ka hadhayow, bal
erayga Rabbiga maqla. Rabbiga ciidammada oo ah Ilaaha
reer binu Israa'iil wuxuu leeyahay, Haddaad wejigiinna ku
qummaatisaan inaad Masar gashaan, oo aad u tagtaan inaad
halkaas degtaan, 16 markaas seefta aad ka cabsanaysaan
ayaa dalka Masar idinku gaadhi doonta, oo abaarta aad
ka baqaysaan ayaa dalka Masar idinku heli doonta, oo
halkaasaad ku dhiman doontaan. 17 Oo saasay wada noqon
doonaan dadkii wejigooda ku qummaatiyaa inay Masar
galaan oo ay halkaas degaan. Waxay ku dhiman doonaan
seef, iyo abaar, iyo belaayo, oo midkoodna kama hadhi
doono, kamana baxsan doono masiibada aan korkooda ku
soo dejin doono. 18 Waayo, Rabbiga ciidammada oo ah
Ilaaha reer binu Israa'iil wuxuu leeyahay, Sidii xanaaqaygii iyo
cadhadaydii ay kuwii Yeruusaalem degganaa ugu dheceen
oo kale ayaa cadhadaydu idiinku dhici doonta markaad dalka
Masar gashaan, oo weliba waxaad wada noqon doontaan
wax aad loo karho, iyo wax laga yaabo, iyo inkaar, iyo cay,
oo meeshanna mar dambe ma aad arki doontaan innaba. 19
Kuwiinna dadka Yahuudah ka hadhayow, Rabbigu wuxuu
idinku soo yidhi, Masar ha tegina. Haddaba bal si xaqiiqa
ah u ogaada inaan maanta idiin digay. 20 Waayo, idinku

nafsaddiinnaad aad u khiyaanayseen, maxaa yeelay, waxaad
ii dirteen Rabbiga Ilaahiinna ah, oo aad igu tidhaahdeen,
Rabbiga Ilaaheenna ah noo bari, oo wax alla wixii Rabbiga
Ilaaheenna ahu uu kugu soo yidhaahdaba noo soo sheeg,
oo annaguna waannu samayn doonnaa. 21 Haddaba maanta
xaalkan waan idiin sheegay, laakiinse idinku ma aydaan
addeecin codkii Rabbiga Ilaahiinna ah iyo wixii uu iigu soo
kiin dhiibay toona. 22 Haddaba bal si xaqiiqa ah u ogaada in
meesha aad doonaysaan inaad tagtaan oo aad sii joogtaan
aad seef iyo abaar iyo belaayo ugu dhiman doontaan.

**43** Oo markii Yeremyaah uu wada dhammeeyey dadka oo
dhan lahadliddiisii uu u sheegayay erayadii Rabbiga
Ilaahooda ah oo dhan, ee Rabbiga Ilaahooda ahu uu ugu
soo dhiibay, kuwaasoo ah erayadan oo dhan, 2 ayaa
waxaa hadlay Casaryaah ina Hooshacyaah, iyo Yooxaanaan
ina Qaaree'ax, iyo raggii kibirsanaa oo dhan, oo waxay
Yeremyaah ku yidhaahdeen, Been baad sheegaysaa.
Rabbiga Ilaaheenna ahu kuuma soo dirin inaad tidhaahdid,
Masar ha tegina inaad halkaas joogtaan, 3 laakiinse Baaruug
ina Neeriiyaah ayaa nagu soo kaa diray, si uu gacanta reer
Kaldayiin noogu rido inay na laayaan, oo ay maxaabiis ahaan
Baabuloon noogu kaxaystaan. 4 Markaasay Yooxaanaan ina
Qaaree'ax, iyo saraakiishii ciidammada oo dhan, iyo dadkii
oo dhammuba addeeci waayeen codkii Rabbiga inay dalkii
Yahuudah degganaadaan. 5 Laakiinse dadkii Yahuudah
ee hadhay oo dhan oo ka soo noqday quruumihii loo kala
kaxaystay oo dhan si ay dalkii Yahuudah u degganaadaan
waxaa kexeeyey Yooxaanaan ina Qaaree'ax iyo saraakiisha
ciidammada oo dhan. 6 Dadkaasu waxay ahaayeen raggii,
iyo naagihii, iyo carruurtii, iyo gabdhihii boqorka, iyo qof kasta
oo Nebuusaradaan oo ahaa sirkaalkii waardiyayaashu uu
kaga tegey Gedalyaah ina Ahiiqaam oo ahaa ina Shaafaan,
iyo Nebi Yeremyaah, iyo Baaruug ina Neeriiyaah. 7 Oo
waxay yimaadeen dalkii Masar, waayo, ma ay addeecin
codkii Rabbiga, oo waxay yimaadeen ilaa Taxfanxees.
8 Markaas Eraygii Rabbiga ayaa Yeremyaah ugu yimid
Taxfanxees, oo wuxuu ku yidhi, 9 Dhagxan waaweyn gacanta
ku qaad, oo iyadoo ay dadka dalka Yahuudah u wada
jeedaan waxaad ku dhex qarisaa meesha lebenku yaal ee
iridda laga galo guriga Fircoon ee Taxfanxees ku yaal. 10
Oo waxaad iyaga ku tidhaadaa, Rabbiga ciidammada oo
ah Ilaaha reer binu Israa'iil wuxuu leeyahay, Bal ogaada,
waxaan soo kaxayn doonaa addoonkayga Nebukadresar
oo ah boqorka Baabuloon, oo carshigiisaan ka dul qotomin
doonaa dhagaxantan aan qariyey, oo isna wuxuu ku dul
fidin doonaa taambuuggiisa boqornimo. 11 Oo isagu wuu
iman doonaa oo wax buu dalka Masar ku dhufan doonaa,
oo kuwii dhimasho ku waajibtay dhimashuu siin doonaa,
kuwii maxaabiisnimo ku waajibtayna maxaabiis ahaan buu u
kaxaysan doonaa, oo kuwii seefu ku waajibtayna seef buu
ku layn doonaa. 12 Oo waxaan dab ku dayn doonaa guryaha
ilaahyada Masar, oo isna wuu gubi doonaa, oo maxaabiis
ahaan buu u kaxaysan doonaa, oo isagu wuxuu dalka Masar
u huwan doonaa sida adhijir uu dharkiisa u huwado oo kale,
oo halkaasna nabad buu kaga bixi doonaa. 13 Oo weliba
wuxuu wada burburin doonaa tiirarka Beytshemesh oo dalka
Masar ku dhex taal, oo guryaha ilaahyada Masarna dab buu
ku wada gubi doonaa.

**44** Kanu waa eraygii Yeremyaah u yimid oo ku
saabsanaa Yuhuuddii dalka Masar degganayd,
kuwaasoo degganaa Migdol, iyo Taxfanxees, iyo Nof, iyo
dalka Fatroos, oo wuxuu ku yidhi, 2 Rabbiga ciidammada
oo ah Ilaaha reer binu Israa'iil wuxuu leeyahay, Waad
aragteen masiibadii aan Yeruusaalem iyo magaalooyinkii
reer Yahuudah oo dhan ku dejiyey, oo bal eega, maantadan
iyagu waa cidla, oo ciduna halkaas ma dhex deggana, 3
waana xumaantooda ay faleen oo ay igaga cadhaysiiyeen
aawadeed markay tageen si ay foox ugu shidaan oo ay
ugu adeegaan ilaahyo kale oo ayan iyaga iyo idinka iyo
awowayaashiinnuba aqoon. 4 Habase ahaatee nebiyadii
addoommadayda ahaa oo dhan ayaan idiin soo diray, anigoo
goor wanaagsan diraya, oo waxaan idhi, Ha samaynina
waxan karaahiyada ah oo aan nebcahay. 5 Laakiinse ma
ay maqlin oo dhegna uma ay dhigin inay xumaantooda
ka soo noqdaan iyo inayan innaba ilaahyo kale foox u
shidin. 6 Oo sidaas daraaddeed ayaa cadhadaydii iyo
xanaaqaygiiba waxay ku soo dheceen oo ay ku ololeen
magaalooyinkii dalka Yahuudah iyo jidadkii Yeruusaalemba,
oo iyana haatan waa cidla iyo baabba' siday maantadan
tahay. 7 Sidaas daraaddeed Rabbiga ah Ilaaha ciidammada
oo ah Ilaaha reer binu Israa'iil wuxuu leeyahay, Bal maxaad
sharkan weyn naftiinna ugu samaysaan, oo aad dalka
Yahuudah uga sii baabbi'isaan rag, iyo naago, iyo carruur,
iyo caanonuug, si aan ciduna idiinka hadhin? 8 Waxaad
igaga cadhaysiisaan shuqullada gacmihiinna idinkoo ilaahyo
kale foox ugu shidaya dalka Masar oo aad u tagteen inaad
degtaan, si laydiin wada baabbi'iyo oo aad quruumaha
dunida oo dhan ugu dhex ahaataan inkaar iyo cay. 9 War
miyaad illowdeen xumaantii awowayaashiin, iyo xumaantii
boqorradii dalka Yahuudah, iyo xumaantii naagahooda,
iyo xumaantiinnii, iyo xumaantii naagihiinna, oo ay dalka
Yahuudah iyo jidadkii Yeruusaalemba ku dhex sameeyeen?

10 Iyagu ilaa maantadan isma ay hoosaysiin, oo kama ay
cabsan, kumana ay socon sharcigaygii iyo qaynuunnadaydii
aan iyaga iyo awowayaashoodba hor dhigay. 11 Sidaas
daraaddeed Rabbiga ciidammada oo ah Ilaaha reer binu
Israa'iil wuxuu leeyahay, Bal eega, wejigaygaan idinku
soo jeedin doonaa inaan dadka Yahuudah oo dhan wada
baabbi'iyo. 12 Oo waxaan qaadan doonaa kuwa dadka
Yahuudah ka hadhay ee wejigooda ku qummaatiyey inay
dalka Masar galaan oo ay halkaas degaan, oo kulligoodna
way wada baabbi'i doonaan, oo waxay ku le'an doonaan
dalka Masar. Waxaa baabba' ka dhigi doona seef iyo abaar,
wayna wada dhiman doonaan, oo kan ugu yar ilaa kan
ugu weyn waxay ku baabbi'i doonaan seef iyo abaar, oo
waxay wada noqon doonaan wax aad loo karho, iyo wax
laga yaabo, iyo inkaar iyo cay. 13 Waayo, kuwa dalka
Masar deggan seef iyo abaar iyo belaayo ayaan ugu ciqaabi
doonaa sidaan Yeruusaalem u ciqaabay oo kale. 14 Markaas
dadka Yahuudah ee hadhay ee dalka Masar u tegey inay
degaan midna kama baxsan doono ama kama hadhi doono
si ay ugu noqdaan dalkii Yahuudah oo ay aad u jecel yihiin
inay ku noqdaan oo ay halkaas degaan, waayo, kuwa
baxsadaa mooyaane midkoodna kuma noqon doono. 15
Markaas dhammaan raggii ogaa inay naagahoodu ilaahyo
kale foox u shidaan, iyo naagihii ag taagnaa oo dhan,
kuwaasoo ahaa dad faro badan oo ahaa dadkii degganaa
dalka Fatroos oo Masar ku yaal oo dhan waxay Yeremyaah
ugu jawaabeen, 16 Annagu innaba kaa dhegaysan mayno
eraygii aad nagula hadashay oo aad magaca Rabbiga
noogu sheegtay. 17 Laakiinse sida xaqiiqada ah waxaannu
samayn doonnaa wax alla wixii afkayaga ka soo baxay,
inaannu foox u shidno boqoradda samada, oo aannu
iyada u daadinno qurbaanno cabniin ah, sidii annaga iyo
awowayaashayo iyo boqorradayadii iyo amiirradayadiiba
aannu ugu samayn jirnay magaalooyinkii dalka Yahuudah
iyo jidadkii Yeruusaalemba, waayo, waagaas waxaannu
haysannay cunto faro badan, oo waannu nabdoonayn, oo
innaba masiibo ma aannu arki jirin. 18 Laakiinse tan iyo
waagii aannu iska daynay inaannu boqoradda samada
foox u shidno oo aannu qurbaanno cabniin ah u daadinno,
wax kastaba waannu u baahnayn, oo seef iyo abaar
baannu ku baabba'nay. 19 Oo markaannu foox u shidnay
boqoradda samada, oo aannu iyada qurbaanno cabniin ah u
daadinnay, miyaannu kibis ugu samaynay innaannu iyada
ku caabudno amase miyaannu iyada qurbaanno cabniin
ah u daadinnay nimankayaga la'aantood? 20 Markaasaa
Yeremyaah dadkii oo dhan, rag iyo naagoba, kuwaasoo
ahaa dadkii isaga sidaas ugu jawaabay oo dhan wuxuu ku
wada yidhi, 21 Idinka iyo awowayaashiin iyo boqorradiinnii
iyo amiirradiinnii iyo dadkii dalkuba fooxii aad magaalooyinka
dalka Yahuudah iyo jidadkii Yeruusaalemba ku dhex shiddeen
miyaan Rabbigu soo xusuusan oo miyaanay qalbigiisa
soo gelin? 22 Markaasuu Rabbigu u sii adkaysan kari
waayay, waana sharka falimihiinna iyo karaahiyada aad
samayseen aawadood, oo sidaas daraaddeed dalkiinnii
wuxuu u noqday cidla, iyo wax laga yaabo, iyo inkaar,
oo ciduna ma deggana siday maantadan tahay. 23 Foox
baad shiddeen, oo Rabbigaad ku dembaabteen, codkiisiina
ma aydaan addeecin, kumana aydaan socon sharcigiisii,
amase qaynuunnadiisii, amase markhaatiyaashiisii, oo
sidaas daraaddeed ayaa masiibadanu idiinku dhacday siday
maantadan tahay. 24 Oo weliba Yeremyaah wuxuu dadkii
oo dhan iyo naagihii oo dhan ku yidhi, Dadka Yahuudah
oo dalka Masar jooga oo dhammow, bal erayga Rabbiga
maqla. 25 Rabbiga ciidammada oo ah Ilaaha reer binu
Israa'iil wuxuu leeyahay, Idinka iyo naagihiinnuba afkiinnaad
ku hadasheen oo gacmihiinnaad ku oofiseen, oo waxaad
tidhaahdeen, Sida xaqiiqada ah annagu waannu oofin
doonnaa nidarradayadii aannu u nidarnay inaannu foox
boqoradda samada u shidno, iyo inaannu iyaga qurbaanno
cabniin ah u daadinno, haddaba nidarradiinna oofiya, oo
nidarradiinna wada sameeya. 26 Haddaba dadka Yahuudah
oo dalka Masar degganow, bal erayga Rabbiga maqla.
Rabbigu wuxuu leeyahay, Bal eega, magacayga weyn waan
ku dhaartay inuusan qof dadka Yahuudah ahu mar dambe
magacayga ku soo magacaabi doonin dalka Masar oo
dhan, isagoo leh, Sayidka Rabbiga ahu waa nool yahay.
27 Bal eega, iyagaan fiirinayaa inaan masiibo ku dejiyo,
wanaagse u keeni maayo, oo dadka Yahuudah oo dalka
Masar jooga oo dhan waxay ku wada baabbi'i doonaan
seef iyo abaar, ilaa ay kulligood wada dhammaadaan. 28
Oo kuwa seefta ka baxsada ayaa dalka Masar ka noqon
doona oo waxay geli doonaan dalkii Yahuudah, waxayna
ahaan doonaan qaar tiro yar, oo kuwa dadka Yahuudah
ka hadhay oo dalka Masar u galay inay halkaas joogaan
oo dhan waxay wada ogaan doonaan erayadayda iyo
kuwooda kuwii rumooba. 29 Oo Rabbigu wuxuu leeyahay,
Waxaa calaamad idiin noqon doonta inaan meeshan idinku
ciqaabi doona, si aad ku ogaataan in erayadaydu ay xaqiiqa
ahaan idiinku rumoobi doonaan inaan masiibo idinku dejin
doono. 30 Rabbigu wuxuu leeyahay, Bal ogaada, Fircoon
Xofrac oo ah boqorka Masar waxaan gelin doonaa gacanta
cadaawayaashiisa, iyo gacanta kuwa naftiisa doondoonaya
sidaan boqorkii dalka Yahuudah oo Sidqiyaah ahaa u geliyey

gacantii Nebukadresar oo ahaa boqorkii Baabuloon, kaasoo
cadowgiisa ahaa oo naftiisa doondooni jiray.

**45** Kanu waa eraygii uu Nebi Yeremyaah kula hadlay
Baaruug ina Neeriiyaah markuu erayadan kitaab kaga
qoray afkii Yeremyaah, taasoo ahayd sannaddii afraad ee
Yehooyaaqiim ina Yoosiyaah uu dalka Yahuudah boqorka
ka ahaa, oo wuxuu ku yidhi, Baaruugow, **2** Rabbiga ah
Ilaaha reer binu Israa'iil wuxuu kugu leeyahay, **3** Adigu
waxaad tidhi, Anigaa iska hoogay haatan, waayo, Rabbigu
xanuunkaygii murug buu iigu sii daray. Taahiddaydii, waan la
daalay, oo innaba nasasho ma aan helin. **4** Waxaad isaga
ku tidhaahdaa, Rabbigu wuxuu leeyahay, Wixii aan dhisay
waan dumin doonaa, oo wixii aan beerayna waan rujin
doonaa, taasuna waa dalka oo dhan. **5** Ma nafsaddaadaad
waxyaalo waaweyn u doondoonaysaa? Ha doondoonin,
waayo, bal ogow, Rabbigu wuxuu leeyahay, Anigu masiibaan
binu-aadmiga oo dhan ku soo dejin doonaa, laakiinse meel
alla meeshii aad tagtidba naftaadaan booli ahaan kuu siin
doonaa.

**46** Kanu waa Eraygii Rabbiga oo Nebi Yeremyaah u
yimid ee quruumaha ku saabsanaa. **2** Wuxuu ka
hadlay Masar, iyo Fircoon Nekoo oo ahaa boqorkii Masar
ciidankiisii, kaasoo joogay Karkemiish Webi Yufraad agtiisa,
oo uu Nebukadresar oo ahaa boqorkii Baabuloon wax ku
dhuftay sannaddii afraad ee Yehooyaaqiim ina Yoosiyaah
oo boqorkii dalka Yahuudah ahaa. **3** Gaashaanka yar
iyo kan weynba diyaariya oo dagaalka u soo dhowaada.
**4** Fardoleydoy, fardaha heenseeya oo fuula, oo isa soo
safa idinkoo koofiyadihiinna dagaalka qaba, oo warmaha
afaysta, oo waxaad soo xidhataan dharka birta ah. **5** Bal
maxaan u arkay? Way nexeen oo dib bay u sii noqdeen, oo
kuwoodii xoogga badnaa waa la wada dilay, oo degdeg bay
u carareen, dibna uma ay soo jeesan, waayo, cabsi baa
dhinac kasta kaga hareeraysnayd, ayaa Rabbigu leeyahay.
**6** Kan dheereeyaa yuusan cararin, oo kan xoogga badanuna
yuusan baxsan. Xagga woqooyi iyo Webi Yufraad agtiisa
ayay ku turunturoodeen, wayna ku dheceen. **7** Yuu yahay kan
u soo kaca sida Webi Niil, oo biyihiisu ay sida webiyaasha u
rogrogmadaan? **8** Dalka Masar ayaa u kaca sida Webi Niil, oo
biyihiisuna way u rogrogmadaan sida webiyaasha oo kale, oo
wuxuu leeyahay, Anigu waan kacayaa, oo dhulkaan dabooli
doonaa, waanan baabbi'in doonaa magaalada iyo dadka
dhex degganba. **9** Fardahow, kaca, oo gaadhifardoodyadow,
yaaca. Ragga xoogga badanuna ha bexeen, kuwaasoo ah
reer Kuush iyo kuwa reer Fuud oo gaashaanka gacanta ku
haya, iyo kuwa reer Luud oo qaansada xoodi yaqaan. **10**
Waayo, taasu waa maalintii Sayidka ah Rabbiga ciidammada,
waana maalin aarsasho, oo uu cadaawayaashiisa ka aarsan
doono. Seeftuna way wada baabbi'in doontaa, wayna ka
dhergi doontaa, oo dhiiggooday ku sakhraami doontaa,
waayo, Sayidka ah Rabbiga ciidammadu wuxuu qurbaan ku
samaynayaa dalka woqooyi Webi Yufraad agtiisa. **11** Dadka
Masar ee sida bikrad oo kale ahow, waxaad tagtaa Gilecaad,
oo beeyo dawo ah soo qaado. Waxtarla'aan baad dawooyin
badan u qaadataa, illowse bogsiini kuuma jirto. **12** Quruumuhu
waxay maqleen ceebtaada, oo qayladaaduna waxay ka
buuxsantay dalka oo dhan, waayo, kuwii xoogga badnaa
ayaa midba kan kale ku turunturooday, oo labadoodiiba way
wada dheceen. **13** Kanu waa eraygii Rabbigu uu kula hadlay
Nebi Yeremyaah, oo ku saabsanaa sida Nebukadresar oo
boqorka Baabuloon ahu uu u iman doono, oo uu dalka
Masar wax ugu dhufan doono. **14** Masar ka dhex sheega,
oo Migdol ka dhex naadiya, oo weliba ka dhex naadiya
Nof iyo Taxfanxeesba, oo waxaad tidhaahdaan, Istaag oo
isdiyaari, waayo, intii kugu wareegsanayd oo dhan seef baa
baabbi'isay. **15** Kuwaagii xoogga badnaa bal maxaa loo kala
xaaqay? Iyagu ma ay istaagin, waayo, Rabbiga ayaa riday.
**16** Kuwa badan ayuu turuntureeyey, oo midba midka kaluu
ku dhacay. Oo waxay isku yidhaahdeen, Kaca oo ina keena,
aynu dadkeennii iyo dalkii aynu ku dhalannay u tagnee, oo
aynu seefta ina dulmaysa ka cararnee. **17** Waxay halkaas
kaga qayliyeen, Fircoon oo ah boqorka Masar waa sanqadh
keliya, wakhtigiina wuu dhaafiyey. **18** Boqorka magiciisu
yahay Rabbiga ciidammadu wuxuu leeyahay, Noloshaydaan
ku dhaartaye. Sida xaqiiqada ah isagu wuxuu u iman doonaa
sida Taaboor oo buuraha ku dhex taal, iyo sida Karmel oo
badda u dhow. **19** Dadka Masar degganow, in maxaabiis
ahaan laguu kaxaysto u alaab ururso, waayo, Nof waxay
noqon doontaa meel cidla iyo baabba' ah oo aan ciduna
degganayn. **20** Masar waa qaalin lo'aad oo qurxoon, laakiinse
halligaad baa xagga woqooyi uga timid, wayna gaadhay. **21**
Oo weliba raggiisa la soo kiraystay oo isaga dhex joogaana
waa sida weylo cayilay, waayo, dib bay u noqdeen, oo
dhammaantood way isla wada carareen, oo innaba ma ay
joogsan, waayo, waxaa soo gaadhay maalintii masiibadooda
iyo wakhtigii ciqaabiddooda. **22** Sanqadhiisu waa sida abeeso
sii gurguuranaysa, waayo, iyagu ciidan bay kula soo socon
doonaan, oo faasas bay kula soo duuli doonaan sida kuwa
qoryo jaraya. **23** Rabbigu wuxuu leeyahay, In kastoo aan
la dhex baadhi karin, kayntiisa waa la wada jari doonaa,
maxaa yeelay, iyagu ayaxa way ka fara badan yihiin, oo
waa wax aan la tirin karin. **24** Dadka Masar way ceeboobi
doonaan, waayo, waxaa lagu ridi doonaa gacanta dadka

woqooyi. 25 Rabbiga ciidammada oo ah Ilaaha reer binu
Israa'iil wuxuu leeyahay, Bal ogaada, waan wada ciqaabi
doonaa Aamoon oo ah ilaaha Noo, iyo Fircoon, iyo Masar,
iyo ilaahyadiisa, iyo boqorradiisa, iyo xataa Fircoon iyo kuwa
isaga isku halleeyaba. 26 Oo waxaan ku ridi doonaa gacanta
kuwa naftooda doondoonaya, iyo gacanta Nebukadresar
oo ah boqorka Baabuloon, iyo gacanta addoommadiisa, oo
markaas dabadeedna waa loo degi doonaa sidii waayihii
hore, ayaa Rabbigu leeyahay. 27 Laakiinse, addoonkayga
reer Yacquubow, ha cabsan, hana nixin, reer binu Israa'iilow,
waayo, bal eeg, meel fog baan kaa badbaadin doonaa,
oo farcankaagana waxaan ka badbaadin doonaa dalka ay
maxaabiista ku yihiin, oo reer Yacquub wuu soo noqon
doonaa oo wuu iska xasilloonaan doonaa oo iska istareexi
doonaa, oo ciduna ma cabsiin doonto innaba. 28 Rabbigu
wuxuu leeyahay, Addoonkayga reer Yacquubow, innaba ha
cabsan, waayo, waan kula jiraa, oo quruumihii aan ku kala
kexeeyey oo dhanna waan wada baabbi'in doonaa, laakiinse
adiga ku wada baabbi'in maayo, caddaalad baanse kugu
edbin doonaa, oo sinaba ciqaabidla'aan kuugu dayn maayo.

**47** Kanu waa Eraygii Rabbiga oo reer Falastiin ku
saabsanaa oo Nebi Yeremyaah u yimid intaan Fircoon
Gaasa wax ku dhufan ka hor. 2 Rabbigu wuxuu leeyahay,
Bal ogaada, xagga woqooyi biyaa ka soo kici doona, oo
waxay noqon doonaan webi aad u daadanaya, oo waxay
qarqin doonaan dalka iyo waxa ku dhex jira oo dhan,
iyo magaalada iyo waxa dhex degganba, oo markaas
ayaa raggu qaylin doonaa, oo dadka dalka deggan oo
dhammuna way wada ooyi doonaan. 3 Gurdanka qoobabka
fardihiisa xoogga badan iyo yaacidda gaadhifardoodyadiisa,
iyo xiinka giraangirihiisa aawadood ayaa aabbayaashu ayan
dib u dhugan doonin carruurtooda, waayo, gacmahoodu
cabsi bay la taag gabeen, 4 waana maalinta u imanaysa
inay reer Falastiin wada baabbi'iso, iyo inay kaalmeeye
kasta oo hadhay Turos iyo Siidoon ka baabbi'iso, waayo,
Rabbigu wuxuu baabbi'in doonaa reer Falastiin iyo kuwa
hadhay ee gasiiradda Kaftoor oo dhan. 5 Baroorashaa
Gaasa heshay, Ashqeloonna waa lala baabbi'iyey kuwii
dooxadooda ku hadhay; ilaa goormaad isgoogooynaysaa? 6
Rabbiga seeftiisay, ilaa goormaad xasilloonaan la'aanaysaa?
Galkaaga gal, naso, oo xasilloonow. 7 Sidee baad u xasilli
kartaa, iyadoo uu Rabbigu ku amray? Ashqeloon iyo badda
xeebteedaba ayuu iyada ku amray.

**48** Rabbiga ciidammada oo ah Ilaaha reer binu Israa'iil
wuxuu reer Moo'aab ka leeyahay, Waxaa iska hoogtay
Neboo! Waayo, iyadu way baabba'day. Qiryaatayim waa
la ceebeeyey oo waa la qabsaday, Misgaabna waa la
ceebeeyey, waana la dumiyey. 2 Dalka Moo'aab ammaan
dambe ma leh. Xeshboon baa shar loogu hindisay, oo waxaa
la yidhaahdaa, Kaalaya oo aynu baabbi'innee si ayan quruun
u sii ahaan. Madmeenay, adigana waa lagu baabbi'in doonaa,
oo seef baa ku eryan doonta. 3 Oo waxaa Xoronayim laga
maqli doonaa oohin qayladeed, kharribaad iyo baabba' weyn
aawadood. 4 Dalka Moo'aab waa la wada baabbi'iyey, oo
dhallaankiisiina qaylo bay maqashiiyeen. 5 Waayo, jiirtii
Luxiid waxaa lala fuuli doonaa oohin aan kala joogsanayn,
waayo, dhaadhaca Xoronayim waxay ka maqleen tiiraanyadii
oohinta baabbi'idda. 6 Carara, oo naftiinna badbaadiya,
oo waxaad noqotaan sida geed xun oo cidlada ku yaal oo
kale. 7 Waayo, waxaad isku hallaysay shuqulladaada iyo
khasnadahaaga, oo sidaas daraaddeed adigana waa lagu
qabsan doonaa, oo Kemooshna maxaabiis ahaan buu u
bixi doonaa, isaga iyo wadaaddadiisa, iyo amiirradiisaba. 8
Oo baabbi'iyuhuna wuxuu ku soo duuli doonaa magaalo
kasta, oo magaalona kama baxsan doonto. Oo weliba
sidii Rabbigu yidhi, Dooxaduna way halligmi doontaa, oo
bannaankuna wuu baabbi'i doonaa. 9 Dalka Moo'aab baalal
siiya si uu u duulo oo uu u cararo. Magaalooyinkiisu waxay
noqon doonaan cidla aan ciduna dhex degganayn. 10
Inkaaru ha ku dhacdo kii shuqulka Rabbiga si dayac ah u
sameeya, oo inkaaru ha ku dhacdo kii seeftiisa dib uga
celiya inay dhiig daadiso. 11 Dalka Moo'aab wuu iska
istareexsanaa tan iyo yaraantiisii, oo sida khamri deggan
ayuu iskaga dul fadhiyey gufarkiisii, oo weelna weel kale
lagagama shubin, oo maxaabbiisahaanna marna looma
kaxaysan, sidaas daraaddeed dhadhankiisii wuu ku sii
hadhay isaga, oo udgoonkiisiina innaba ma beddelmin. 12
Sidaas daraaddeed Rabbigu wuxuu leeyahay, Bal eega,
waxaa iman doona wakhti aan isaga u soo diri doono
kuwa wax shuba, isagayna shubayaan, oo weelashiisay
madhinayaan, oo jalxadihiisana wada burburinayaan. 13
Sidii reer binu Israa'iil ay Beytel oo ay ku kalsoonaayeen
ugu ceeboobeen, sidaas oo kale ayaa reer Moo'aabna
Kemoosh ugu ceeboobi doonaa. 14 Idinku sidee baad u
odhan kartaan, Annagu waxaannu nahay dagaalyahan iyo
rag u xoog badan dagaalka? 15 Boqorka magiciisu yahay
Rabbiga ciidammadu wuxuu leeyahay, Dalka Moo'aab cidla
buu noqday, oo magaalooyinkiisiina way baabbe'een, oo
kuwa barbaarradiisii u wanaagsanaana waxay hoos ugu
dhaadheceen in la gowraco. 16 Moo'aab masiibadiisii mar
dhow bay imanaysaa, oo dhibtiisiina aad iyo aad bay u soo
degdegaysaa. 17 Kuwiinna hareerihiisa ku wareegsan oo
magiciisa yaqaan oo dhammow, u baroorta, oo waxaad

tidhaahdaan, Ushii xoogga iyo quruxda badnayd sidee bay u
kala jabtay! 18 Dadka Diibon degganow, sharaftaada hoos
uga soo deg oo oon la fadhiiso, waayo, waxaa kugu soo
duulay baabbi'iyaha Moo'aab, oo isagu wuxuu dumiyey
qalcadahaaga adadag. 19 Kuwiinna Carooceer degganow,
bal jidka dhiniciisa istaaga, oo bal wax fiiriya, oo kan
sii cararaya iyo tan sii baxsanaysa waxaad weyddiisaan
waxa dhacay. 20 Moo'aab waa la ceebeeyey, waayo, wuu
baabba'ay. Haddaba ooya oo qayliya, oo Arnoon ka sheega
in Moo'aab baabba'ay. 21 Xukun baa ku dhacay dalka
bannaanka ah, iyo Xolon, iyo Yahsaah, iyo Mefacad, 22 iyo
Diibon, iyo Neboo, iyo Beytdiblaatayim, 23 iyo Qiryaatayim,
iyo Beytgaamuul, iyo Beytmecoon, 24 iyo Qiryood, iyo
Bosraah, iyo magaalooyinka dalka Moo'aab oo dhan, kuwa
dhow iyo kuwa fogba. 25 Rabbigu wuxuu leeyahay, Dalka
Moo'aab geeskiisii waa la gooyay oo gacantiisiina waa
jabtay. 26 Isaga sakhraamiya, waayo, Rabbiguu iska sii
weyneeyey, oo Moo'aab wuxuu ku dhex galgalan doonaa
mantaggiisa, oo weliba wuxuu noqon doonaa wax lagu
qoslo. 27 Waayo, miyaan dalka Israa'iil wax lagu qoslo kuu
ahayn? Miyaase isaga laga helay tuugag dhexdood? Waayo,
markaad isaga ka hadashidba madaxaad ruxruxdaa. 28
Kuwa dalka Moo'aab degganow, magaalooyinka ka taga,
oo dhagaxa weyn ku hoyda, oo waxaad la mid noqotaan
sidii qoolleyda buulkeeda ka samaysata dhinacyada bohol
afkeeda. 29 Waxaannu maqalnay kibirkii Moo'aab oo uu
aad u kibray, iyo xataa kor-isu-qaadiddiisa, iyo kibirkiisa,
iyo madaxweynaantiisa, iyo qabweynaanta qalbigiisaba.
30 Rabbigu wuxuu leeyahay, Anigu waan ogahay inaan
cadhadiisu waxba ahayn oo faankiisuna innaba waxba
tarayn. 31 Sidaas daraaddeed Moo'aab waan u barooran
doonaa, oo waxaan u qaylin doonaa reer Moo'aab oo dhan
daraaddood, waana loo barooran doonaa dadka Qiir Xeres.
32 Canabka Sibmaahow, waxaan kuugu ooyi doonaa oohin
ka sii daran tii Yacser. Laamahaagii badday dhaafeen, oo
waxay gaadheen xataa tan iyo badda Yacser. Baabbi'iyihii
wuxuu soo dhacay midhahaagii la hor guray iyo canabkaagii.
33 Farxadda iyo rayraynta waa laga qaaday beertii midhaha
badnayd iyo dalka Moo'aabba, oo waxaan ka dhigay in
khamri macsarooyinka laga waayo, oo ciduna kuma tuman
doonto iyagoo heesaya, oo heestooduna innaba hees
ma noqon doonto. 34 Qayladii Xeshboon waxay gaadhay
Elecaaleeh iyo tan iyo Yahas, oo waxaa laga dhawaaqay
Socar iyo ilaa Xoronayim iyo ilaa Ceglad Shelishiyaah,
waayo, xataa biyihii Nimriim way baabba'ayaan. 35 Oo weliba
Rabbigu wuxuu leeyahay, Waxaan Moo'aab ka joojin doonaa
kan meesha sare allabariga ku bixiya, iyo kan ilaahyadiisa
fooxa u shidaba. 36 Oo sidaas daraaddeed dalka Moo'aab
aawadiis qalbigaygu waa u dhawaaqaa sida biibiile oo kale,
oo dadka Qiir Xeres aawadoodna qalbigaygu sida biibiile oo
kale waa u dhawaaqaa, saas aawadeed maalkii badnaa
ee ay heleen waa ka wada baabba'ay. 37 Waayo, madax
kastaba waa la xiiray, oo gadh kastaba waa la jaray, oo
gacmaha oo dhanna nabaraa ku kor yaal, oo dhexdana
joonyad baa ku xidhan. 38 Rabbigu wuxuu leeyahay, Guryaha
Moo'aab dushooda, iyo jidadkiisa dhexdooda waxaa meel
kasta jira baroorasho, waayo, Moo'aab waxaan u burburiyey
sidii weel aan la doonaynin oo kale. 39 Sidee buu u dumay!
Sidee baa reer Moo'aab dhabarka ceeb ula sii jeediyey!
Markaasuu reer Moo'aab kuwa hareerihiisa ku wareegsan
oo dhan u noqon doonaa wax lagu qoslo oo lagu naxo. 40
Waayo, Rabbigu wuxuu leeyahay, Bal eega, wuxuu u soo
duuli doonaa sida gorgor oo kale, oo baalashiisana wuxuu
ku fidin doonaa dalka Moo'aab. 41 Qiryood waa la qabsaday,
oo qalcadihiina waa la argaggixiyey, oo ragga xoogga badan
ee Moo'aab qalbigoodu wuxuu maalintaas noqon doonaa
sida naag fooli hayso qalbigeed oo kale. 42 Oo Moo'aab
waa la baabbi'in doonaa si uusan innaba quruun u sii ahaan,
maxaa yeelay, Rabbiguu iska sii weyneeyey. 43 Rabbigu
wuxuu leeyahay, Kan Moo'aab degganow, waxaa ku hor
yaal cabsi, iyo yamays, iyo dabin. 44 Kii cabsida ka cararaa
wuxuu ku dhici doonaa yamayska, oo kii yamayska ka soo
baxana waxaa qaban doona dabinka, waayo, Rabbigu wuxuu
leeyahay, Waxaan reer Moo'aab ku soo dul dejin doonaa
sannaddii ciqaabiddooda. 45 Kuwii cararay waxay istaagan
yihiin hooska Xeshboon, iyagoo taag gabay, waayo, dab baa
Xeshboon ka soo baxay, ololna wuxuu ka soo baxay Siixon
dhexdeeda, oo wuxuu baabbi'iyey Moo'aab darafkeeda iyo
kuwa bulxanka badan dhaladooda. 46 Moo'aabow, adigaa
iska hoogay, Kemoosh dadkiisii way wada halligmeen, maxaa
yeelay, wiilashaadii maxaabiis ahaan baa loo kaxaystay, oo
gabdhahaagiina waa la wada kaxaystay. 47 Laakiin Rabbigu
wuxuu leeyahay, Ugudambaysta maxaabiista reer Moo'aab
waan soo celin doonaa. Intaasu waa xukunkii reer Moo'aab.

**49** Rabbigu wuxuu reer Cammoon ka leeyahay, Israa'iil
miyuusan wiilal lahayn? Miyuusan mid dhaxla lahayn?
Bal maxaa Malkaam u dhaxlay Gaad, oo maxaase dadkiisu
u degay magaalooyinkii reer Gaad? 2 Sidaas daraaddeed
Rabbigu wuxuu leeyahay, Bal ogaada, waxaa iman doona
wakhti aan ka dhigi doono in la maqlo qaylo dagaaleed oo
ka gees ah magaalada Rabbaah ee reer Cammoon, oo
waxay noqon doontaa taallo burbur ah, oo gabdhaheedana
dab baa lagu wada gubi doonaa, oo markaasay dadka
Israa'iil dhaxli doonaan kuwii iyaga dhaxli jiray, ayaa Rabbigu

leeyahay. 3 Xeshboonay, barooro, waayo, Aacii waa
baabba'day. Gabdhaha Rabbaahoy, ooya, dhar joonyad ah
guntada, oo baroorta, oo hore iyo dib ugu orda deyrarka
dhexdooda, waayo, Malkaam maxaabiis ahaan buu u bixi
doonaa, isaga iyo wadaaddadiisa iyo amiirradiisaba. 4
Kaaga dib u noqonayow, bal maxaad dooxooyinkaaga ugu
faanaysaa? Waayo, dooxadaadu way sii dhammaanaysaa.
Khasnadahaagaad isku hallaysay oo waxaad tidhi, Bal
yaa ii iman karaya? 5 Sayidka ah Rabbiga ciidammadu
wuxuu leeyahay, Waxaan kugu soo dejin doonaa cabsi
kaaga timaada kuwa hareerahaaga ku wareegsan oo dhan.
Oo midkiin kastaba hor baa loo eryi doonaa, oo cid kuwa
warwareega soo ururisaana ma jiri doonto. 6 Laakiin
haddana mar kalaan maxaabiista reer Cammoon soo celin
doonaa, ayaa Rabbigu leeyahay. 7 Rabbiga ciidammadu
wuxuu reer Edom ka leeyahay, Teemaan miyaan xigmad
lagu sii arag innaba? Taladii miyey ka baabba'day kuwii
miyirka lahaa? Xigmaddoodii miyey ka wada dhammaatay?
8 Dadka Dedaan degganow, carara, oo dib u noqda, oo
meelo hul dheer dega, waayo, reer Ceesaw waxaan ku soo
dejin doonaa masiibadiisa oo dhan, waana wakhtiga aan
isaga ciqaabi doono. 9 Haddii kuwa canab ururiya ay kuu
yimaadaan, sow kaagama ay tageen canab xaaxaab ah?
Haddiise tuugag ay habeenkii kuu miraan, sow kama ay
tageen markay wax ku filan helaan? 10 Laakiinse anigu
reer Ceesaw waan qaawiyey, oo meelihiisii qarsoonaana
daahaan ka wada qaaday, oo isna ma uu kari doono inuu
isqariyo. Farcankiisii iyo walaalihiis iyo deriskiisiiba way wada
baabbe'een oo isagiina innaba ma jiro. 11 Carruurtaada
agoonta ah ka tag oo aniguna waan xannaanayn doonaa
si ay u sii noolaadaan, oo carmalladaaduna ha isku kay
halleeyeen. 12 Waayo, Rabbigu wuxuu leeyahay, Bal eega,
kuwii ayan ku garta ahayn inay koobka cabbaan, xaqiiqa
ahaan bay u cabbi doonaan. Haddaba adigu miyaad tahay
mid aan la ciqaabi doonin? Adigu ciqaabidla'aan innaba ma
sii joogi doontid, laakiinse sida xaqiiqada ah waad cabbi
doontaa. 13 Waayo, Rabbigu wuxuu leeyahay, Waxaan ku
dhaartay nafsaddayda inay Bosraah noqon doonto cidla,
iyo cay, iyo burbur, iyo inkaar, oo magaalooyinkeeda oo
dhammuna weligoodba cidla bay ahaan doonaan. 14 War
baan xagga Rabbiga ka maqlay, oo quruumahana waxaa
loo dhex diray wargeeys leh, Isa soo wada urursada, oo
iyada ku soo duula, oo dagaalka u soo kaca. 15 Waayo,
bal eeg, waxaan kaa dhigay mid quruumaha dhexdooda
ku yar, oo dadka dhexdiisana lagu quudhsado. 16 Kaaga
qurarka dhagaxyadooda deggan oo kurta dhaladeeda sare
haystow, belaayonimadaada iyo kibirka qalbigaaga ayaa ku
khiyaanay, waayo, Rabbigu wuxuu leeyahay, In kastoo aad
buulkaaga meel sare ka samaysatid sida kan gorgorka oo
kale, anigu halkaas hoos baan kaaga soo dejin doonaa.
17 Oo weliba Edomna waxay noqon doontaa cidla, oo mid
kasta oo ag maraaba wuu la yaabi doonaa, wuuna ku
foodhyi doonaa belaayooyinkeeda oo dhan. 18 Rabbigu
wuxuu leeyahay, Sidii afgembigii Sodom iyo Gomora iyo
magaalooyinkii u dhowaa oo kale, ciduna halkaas ma joogi
doonto, oo innaba binu-aadmi halkaas ma degganaan
doono. 19 Bal eega, isagu wuxuu kibirka Webi Urdun uga
soo dhex bixi doonaa sida libaax oo kale, oo wuxuu ku soo
kici doonaa rugta xoogga badan, laakiinse anigu waxaan ka
dhigi doonaa inuu degdeg uga cararo, oo waxaan madax
uga dhigi doonaa kii la doortay, waayo, bal yaa ila mid
ah? Oo bal yaa wakhtiga ii sheegi doona? Oo waa ayo
adhijirka hortayda soo istaagi doona? 20 Haddaba bal maqla
talada uu Rabbigu Edom u goostay, iyo qasdiyadiisa uu
dadka Teemaan deggan u qasdiyey. Sida xaqiiqada ah
waxaa iyaga kaxayn doona kuwa adhiga ugu yaryar. Sida
xaqiiqada ah isagu hoygooda iyo iyagaba cidla buu ka dhigi
doonaa. 21 Dhulkii wuxuu la gariiraa sanqadhii dhiciddooda,
oo qayladoodana waxaa laga maqlaa tan iyo Badda Cas. 22
Bal ogaada, isagu wuu soo kici doonaa oo wuxuu u soo duuli
doonaa sida gorgor oo kale, oo baalashiisana wuxuu ku
fidin doonaa Bosraah, oo maalintaas ragga xoogga badan
oo reer Edom qalbigoodu wuxuu noqon doonaa sida naag
fooli hayso qalbigeed oo kale. 23 Oo Dimishaqna wuxuu
ka leeyahay, Xamaad iyo Arfaad way nexeen, waayo, war
xun bay maqleen, wayna qalbi jabeen, oo baddana welwel
baa jira, oo innaba ma ay xasilli karto. 24 Dimishaq way
taag gabtay, oo waxay u jeesatay inay cararto. Naxdin baa
ku dhacday, oo cidhiidhi iyo xanuun baa qabtay sidii naag
foolanaysa oo kale. 25 Magaaladii ammaanta lahayd oo aan
ku faraxsanaa sidee baan looga tegin! 26 Sidaas daraaddeed
barbaarradeedu waxay ku dhex dhici doonaan jidadkeeda,
oo raggeeda dagaalka oo dhanna maalintaasaa la wada
baabbi'in doonaa, ayaa Rabbiga ciidammadu leeyahay.
27 Oo derbiga Dimishaq dab baan ku dayn doonaa, oo
daaraha waaweyn ee Benhadad oo dhanna baabba' buu ka
dhigi doonaa. 28 Qedaar iyo boqortooyooyinka Xaasoor oo
boqorka Baabuloon oo Nebukadresar ahu uu wax ku dhuftay
Rabbigu wuxuu ka leeyahay, Sara joogsada, oo Qedaar u
kaca, oo dadka reer bari baabbi'iya. 29 Teendhooyinkooda
iyo adhyahoodaba way wada kaxaysan doonaan, oo waxay
iska qaadan doonaan daahyadooda iyo weelashooda oo
dhan iyo geeloodaba, oo waxay iyaga ugu qaylin doonaan,
Dhinac kasta cabsi baa idinka jirta. 30 Rabbigu wuxuu

leeyahay, Dadka Xaasoor degganow, carara, oo aad u sii
fogaada, oo meelo hul dheer dega, waayo, Nebukadresar
oo ah boqorka Baabuloon ayaa idiin tashaday, oo wax
xun buu idiin qasdiyey. 31 Rabbigu wuxuu leeyahay, Sara
joogsada, oo ku kaca quruun istareexsan, oo welwella'aan
isaga deggan, oo aan albaabbo iyo qataarro midna lahayn,
oo keligeed deggan. 32 Oo Rabbigu wuxuu leeyahay,
Geeloodu wuxuu noqon doonaa booli, oo xoolahooda
badanna waa la kala boobi doonaa, oo waxaan dabaylaha
oo dhan u kala firdhin doonaa kuwa timaha dhinacyada ka
jarta, oo masiibadoodana waxaan kaga soo dayn doonaa
dhinac kasta. 33 Oo Xaasoorna waxay noqon doontaa
meel dawacooyin ku hoydaan iyo meel weligeed cidla ah,
ciduna halkaas ma joogi doonto oo innaba binu-aadmina
ma degganaan doono. 34 Kanu waa Eraygii Rabbiga ee
Ceelaam ku saabsanaa ee Nebi Yeremyaah u yimid bilowgii
boqornimadii Sidqiyaah oo boqor ka ahaa dalka Yahuudah,
isagoo leh, 35 Rabbiga ciidammadu wuxuu leeyahay, Bal
ogaada, Anigu waxaan kala jebin doonaa qaansada reer
Ceelaam, taasoo ah waxa xooggooda u weyn. 36 Oo waxaan
reer Ceelaam ku soo dayn doonaa afarta dabaylood oo
samada afarteeda qabladood ka timid, oo iyaga waxaan u
kala firdhin doonaa qabladahaas oo dhan, oo innaba ma ay
jiri doonto quruun aan reer Ceelaam masaafurisyadoodu
geli doonin. 37 Waayo, Rabbigu wuxuu leeyahay, Anigu
waxaan ka dhigi doonaa in reer Ceelaam ay ku hor naxaan
cadaawayaashooda iyo kuwa naftooda doondoonaya, oo
masiibo ah cadhadayda kulul ayaan ku soo dejin doonaa,
oo seefna waan ka daba diri doonaa, ilaa aan baabba' ka
dhigo. 38 Oo Rabbigu wuxuu leeyahay, Anigu carshigayga
Ceelaam baan dhex qotomin doonaa, oo halkaas boqor iyo
amiirroba waan ka wada baabbi'in doonaa. 39 Laakiinse
Rabbigu wuxuu leeyahay, Ugudambaysta maxaabiista reer
Ceelaam waan soo celin doonaa.

**50** Kanu waa eraygii ku saabsanaa Baabuloon iyo dalka
reer Kaldayiin ee uu Rabbigu Nebi Yeremyaah faray. 2
Quruumaha ka dhex sheega, oo naadiya, oo calan kor u
taaga. Naadiya, oo ha qarinina, oo waxaad tidhaahdaan,
Baabuloon waa la qabsaday, Beel waa la ceebeeyey,
Merodag waa la burburiyey, taswiiraheedii waa la ceebeeyey,
oo sanamyadeediina waa la burburiyey. 3 Waayo, quruun baa
xagga woqooyi iyada kaga soo kacaysa, taasoo dalkeeda
cidla ka dhigi doonta, oo ciduna ma dhex degganaan
doonto, oo dad iyo duunyaba way carareen, wayna tageen.
4 Rabbigu wuxuu leeyahay, Maalmahaas iyo wakhtigaas
waxaa iman doona dadka Israa'iil iyo dadka Yahuudah oo
wada socda oo ooyaya, oo Rabbiga Ilaahooda ahna way
doondooni doonaan. 5 Iyagu waxay haybin doonaan jidka
Siyoon iyagoo wejigoodu halkan u soo jeedo, oo waxay
odhan doonaan, Kaalaya, oo Rabbiga ugu dhowaada axdi
weligiis ah oo aan la illoobi doonin. 6 Dadkaygu wuxuu
ahaan jiray sidii ido baadiyoobay, oo adhijirradoodii ayaa
ka dhigay inay ambadaan. Waxay u celiyeen oo ku sii
daayeen xagga buuraha, oo intay buur ilaa kur uga sii
bexeen ayay xeradoodii illoobeen. 7 Ku alla kii iyaga helayba
wuu cunay, oo cadaawayaashoodiina waxay yidhaahdeen,
Annagu dembi kuma lihin, maxaa yeelay, iyagu waxay
ku dembaabeen Rabbiga ah rugtii caddaaladda, kaasoo
ah Rabbigii ahaa rajadii awowayaashood. 8 Baabuloon
dhexdeeda ka carara, oo dalka reer Kaldayiin ka dhex baxa,
oo noqda sida orgiyo adhi hor socda oo kale. 9 Waayo,
bal ogaada, waxaan kicin doonaa oo aan Baabuloon ku
soo dayn doonaa quruumo waaweyn oo is-urursaday oo
xagga dalka woqooyi ka yimid, oo dagaal bay isugu soo
diyaarin doonaan oo halkaasaa laga qaadi doonaa. Oo
fallaadhahoodu waxay noqon doonaan sida fallaadhaha kan
dagaalka aqoonta u leh oo aan middoodna waxtarla'aan
ku soo noqonayn. 10 Oo Rabbigu wuxuu leeyahay, Dalka
Kalday wuxuu noqon doonaa wax la dhaco, oo kuwii isaga
dhaca oo dhammuna way wada dhergi doonaan. 11 Kuwiinna
dhaxalkayga dhacayow, in kastoo aad faraxdaan oo aad
rayraysaan, iyo in kastoo aad u cayishaan sida qaalin lo'aad
oo daaqsin fiican dhex joogta, amase aad danantaan sida
fardo xoog badan oo kale, 12 kolley hooyadiin si xun bay
u ceeboobi doontaa, oo tii idin dhashayna way welweli
doontaa, oo bal ogaada, iyadu waxay ahaan doontaa midda
quruumaha ugu wada dambaysa, iyo cidla, iyo dhul engegan,
iyo lamadegaan. 13 Cadhada Rabbiga daraaddeed ayaan
ciduna u degi doonin, laakiinse kulligeed waxay ahaan
doontaa baabba'. Mid kasta oo Baabuloon soo ag maraaba
wuu yaabi doonaa, oo belaayooyinkeeda oo dhanna wuu ku
foodhyi doonaa. 14 Kuwiinna qaansada xoota oo dhammow,
Baabuloon hareereheeda dagaal isugu diyaariya. Iyada
fallaadhihiinna ku gana, oo fallaadhna ha ka ceshanina,
waayo, Rabbigay ku dembaabtay. 15 Hareeraha kaga
qayliya, iyadu way isdhiibtay, aasaaskeedii wuu dhacay,
derbiyadeediina waa la wada dumiyey, waayo, taasu waa
aarsashadii Rabbiga. Iyada ka aarsada, oo sidii ay yeeli
jirtay iyada ku sameeya. 16 Baabuloon ka baabbi'iya kan
wax beera iyo kan manjada qaada wakhtiga beergoosadka.
Seefta dulmaysa cabsi ay ka qabaan aawadeed ayaa
midkood kastaaba ku noqon doonaa dadkiisii, oo midkood
kastaaba u carari doonaa dalkiisii. 17 Dadka Israa'iil waa

sida ido kala firidhsan oo kale. Libaaxyaa kala eryay. Markii
hore waxaa baabbi'iyey boqorkii Ashuur, oo markii dambena
Nebukadresar oo ah boqorka Baabuloon ayaa lafihiisii
burbursaday. **18** Sidaas daraaddeed Rabbiga ciidammada
oo ah Ilaaha reer binu Israa'iil wuxuu leeyahay, Bal ogaada,
boqorka Baabuloon iyo dalkiisaba waan u ciqaabi doonaa
sidaan boqorkii Ashuur u ciqaabay oo kale. **19** Oo dadka
Israa'iilna xeradooda ayaan ku soo celin doonaa, oo waxay
daaqi doonaan Karmel iyo Baashaan, oo nafsaddooduna
waxay ka dhergi doontaa buuraha Efrayim iyo Gilecaad
dhexdiisa. **20** Rabbigu wuxuu leeyahay, Maalmahaas iyo
wakhtigaas waxaa la doondooni doonaa xumaantii dadka
Israa'iil oo innaba ma ay jiri doonto, iyo dembiyadii dadka
Yahuudah oo innaba lama heli doono, waayo, kuwii aan soo
reebay waan saamixi doonaa. **21** Rabbigu wuxuu leeyahay,
Ku soo kaca dalka Meraatayim, iyo dadka Feqood degganba.
Laaya oo wada baabbi'iya oo sidaan idinku amray oo dhan
yeela. **22** Dalka waxaa dhex yaal dagaal iyo halligaad
weyn sanqadhood. **23** Dubbihii dunida oo dhammu sidee
buu u kala jabay oo uu u burburay! Baabuloon sidee bay
quruumaha dhexdooda cidla ugu noqotay! **24** Baabuloonay,
dabin baan kuu dhigay, oo adna waa lagu qabtay adigoo aan
iska ogayn. Waa lagu helay oo lagu qabtay, maxaa yeelay,
Rabbigaad la dirirtay. **25** Rabbigu meesha hubkiisuu furay,
oo wuxuu soo bixiyey hubkii dhirifkiisa, waayo, Sayidka ah
Rabbiga ciidammadu wuxuu leeyahay shuqul uu ku dhex
samayn doono dalka reer Kaldayiin. **26** Quruuntaas kaga soo
kaca darafyada dhulka ugu shisheeya, oo bakhaarradeeda
fura, oo waxaad iyada u taalaysaan sida wax meel tuunsan
oo kale, oo dhammaanteed baabbi'iya, oo innaba waxba
ha ka reebina. **27** Dibiyadeeda oo dhan wada gowraca,
oo kulligood in la gowraco ha u dhaadheceen. Iyagaa
iska hoogay, waayo, waxaa haatan yimid maalintoodii iyo
wakhtigii ciqaabiddooda! **28** Waxaa yeedhaya codkii kuwa
dalka Baabuloon ka sii cararaya oo ka baxsanaya inay
Siyoon ka naadiyaan aarsashadii Rabbiga Ilaahayaga ah,
taasoo ah aarsashadii macbudkiisa. **29** Waxaad Baabuloon
ugu yeedhaan qaansoley badan, kuwiinna qaansada xoota
oo dhammow. Hareereheeda ka dega, oo yaan innaba
waxba ka baxsan. U abaalmariya sidii shuqulkeedu ahaa,
oo wixii ay samayn jirtay oo dhan ku sameeya, waayo,
waxay ku kibirtay Rabbiga ah Kan Quduuska ah ee reer
binu Israa'iil. **30** Sidaas daraaddeed barbaarradeedu waxay
ku dhex dhici doonaan jidadkeeda, oo raggeeda dagaalka
oo dhanna maalintaasaa la wada baabbi'in doonaa, ayaa
Rabbigu leeyahay. **31** Sayidka ah Rabbiga ciidammadu
wuxuu leeyahay, Bal eeg, kan kibirka badanow, anigu col
baan kugu ahay, waayo, waxaa yimid maalintaadii taasoo ah
wakhtigii aan ku ciqaabi lahaa. **32** Oo kan kibirka badanuna
wuu turunturoon doonaa, wuuna dhici doonaa, oo ciduna ma
sara kicin doonto. Oo magaalooyinkiisana dab baan ku dayn
doonaa, oo dabkaasuna wuxuu wada baabbi'in doonaa inta
hareerihiisa ku wareegsan oo dhan. **33** Rabbiga ciidammadu
wuxuu leeyahay, Dadka Israa'iil iyo dadka Yahuudahba
waa la wada dulmay, oo kuwii iyaga maxaabiis ahaanta u
kaxaystayna aad bay u xajistaan, wayna diidaan inay iska
sii daayaan. **34** Bixiyahoodu waa xoog badan yahay, oo
magiciisana waxaa la yidhaahdaa Rabbiga ciidammada.
Oo isagu sida xaqiiqada ah dacwadooda wuu u qaadi
doonaa, si uu dhulka u nasiyo, oo uu kuwa Baabuloon
deggan u gariiriyo. **35** Rabbigu wuxuu leeyahay, Reer
Kaldayiin, iyo kuwa Baabuloon deggan, iyo amiirradeeda,
iyo raggeeda xigmadda lehba seef baa u diyaar ah. **36**
Oo faanlowyadana seef baa u diyaar ah, wayna nacasoobi
doonaan, oo raggeeda xoogga badanna seef baa u diyaar
ah, wayna argaggixi doonaan. **37** Oo seef baa u diyaar ah
fardahooda, iyo gaadhifardoodyadooda, iyo dadka isku qasan
oo dhexdeeda jooga oo dhan, oo waxay noqon doonaan
sida naago oo kale. Oo khasnadaheedana seef baa u diyaar
ah, oo iyana waa la dhici doonaa. **38** Biyaheedana abaar baa
u diyaar ah, wayna wada gudhi doonaan, waayo, kanu waa
dal ay taswiiro xardhanu ka buuxaan, oo dadkuna sanamyo
bay ka daba waashaan. **39** Sidaas daraaddeed dugaagga
lamadegaanku waxay halkaas la degganaan doonaan yeyda,
oo weliba gorayooyinka ayaa halkaas ku hoyan doona, oo
weligeedna mar dambe lama degi doono, oo tan iyo ab ka
abna dhexdeeda innaba laguma hoyan doono. **40** Rabbigu
wuxuu leeyahay, Sidii Ilaah u afgembiyey Sodom iyo Gomora
iyo magaalooyinkii u dhowaaba ayaan ciduna halkaas u joogi
doonin oo uusan innaba binu-aadmina halkaas degganaan
doonin. **41** Bal ogaada, dadyow baa xagga woqooyi ka
iman doona, oo quruun weyn iyo boqorro badan ayaa
dhulka darafyadiisa ka soo kici doona. **42** Oo waxay sitaan
qaansooyin iyo warmo, oo waa calool adag yihiin, oo innaba
naxariis ma leh. Codkoodana waxaa la moodaa sida bad
guuxaysa oo kale, oo farday fuulaan. Baabuloonay, mid
kastaaba wuxuu kuugu soo safan yahay sida nin dagaal
diyaar u ah oo kale. **43** Boqorkii Baabuloon ayaa warkoodii
maqlay, markaasay gacmihiisii taag gabeen, oo cidhiidhi
iyo xanuun baa isagii qabtay sida naag foolanaysa oo kale.
**44** Bal eega, isagu wuxuu kibirka Webi Urdun uga soo
dhex bixi doonaa sida libaax oo kale, oo wuxuu ku soo kici
doonaa rugta xoogga badan, laakiinse anigu waxaan ka
dhigi doonaa inay degdeg uga cararaan, oo waxaan madax

uga dhigi doonaa kii la doortay, waayo, bal yaa ila mid ah?
Oo bal yaa wakhtiga ii sheegi doona? Oo waa ayo adhijirka
hortayda soo istaagi doona? 45 Haddaba bal maqla talada
uu Rabbigu Baabuloon u goostay, iyo qasdiyadiisa uu dalka
reer Kaldayiin u qasdiyey. Sida xaqiiqada ah waxaa iyaga
kaxayn doona kuwa adhiga ugu yaryar. Sida xaqiiqada ah
isagu hoygooda iyo iyagaba cidla buu ka dhigi doonaa. 46
Dhulkii wuxuu la gariiraa sanqadhii qabsashadii Baabuloon,
oo qayladeeda waxaa laga maqlaa quruumaha dhexdooda.

51 Rabbigu wuxuu leeyahay, Bal ogaada, anigu Baabuloon
iyo kuwa dalka reer Kaldayiin dhex degganba waxaan
ku soo kicin doonaa dabayl wax baabbi'isa. 2 Oo Baabuloonna
waxaan u soo diri doonaa haadiyayaal, oo iyaday haadin
doonaan, oo dalkeedana way madhin doonaan, waayo,
maalinta dhibaatada dhinac kastay kaga soo duuli doonaan.
3 Kii qaanso xoota iyo kii dharkiisa birta ah la sara kacaba
qaansoluhu qaansadiisa ha u xooto, oo barbaarradeedana
ha u tudhina, oo ciidankeeda oo dhanna wada baabbi'iya. 4
Oo kuwa la layn doono waxay ku dhex dhici doonaan dalka
reer Kaldayiin, oo kuwa la dooxdooxi doonona waxay ku
dhici doonaan jidadkeeda. 5 Waayo, dadka Israa'iil iyo dadka
Yahuudah toona Ilaahooda ah Rabbiga ciidammadu innaba
ma dayrin, in kastoo dalkoodii uu ka buuxsamay dembi ay
ku sameeyeen Kan Quduuska ah ee reer binu Israa'iil. 6
Baabuloon dhexdeeda ka carara, oo nin kastaaba naftiisa ha
la baxsado. Xumaanteeda ha ku dhex baabbi'ina, waayo,
haatan waa wakhti uu Rabbigu ka aarsan doono, oo iyada
wuu abaalmarin doonaa. 7 Baabuloon waxay ahayd koob
dahab ah oo Rabbiga gacantiisa ku jira oo dunida oo dhan
sakhraamiyey. Quruumuhu waxay cabbeen khamrigeedii,
oo sidaas daraaddeed quruumihii way wada waasheen.
8 Baabuloon dhaqso bay u dhacday, wayna baabba'day.
Iyada u baroorta oo xanuunkeeda beeyo dawo ah u qaada,
hadday saas ku bogsanayso. 9 Annagu Baabuloon waannu
dawayn lahayn, laakiinse iyadu ma ay bogsan. Iyada ka taga
oo midkeen kastaaba dalkiisii ha tago, waayo, xukunkeedii
wuxuu gaadhay tan iyo samada, oo waxaa kor loogu qaaday
tan iyo cirka. 10 Rabbigu wuxuu soo saaray xaqnimadeennii,
ina keena oo aynu Siyoon ka caddayno shuqulka Rabbiga
Ilaaheenna ah. 11 Fallaadhaha afaysta, oo gaashaammada
qaada, waayo, Rabbigu wuxuu sara kiciyey ruuxii boqorradii
reer Maaday, waayo, qasdigiisu waa inuu Baabuloon
baabbi'iyo, maxaa yeelay, taasu waa aarsashadii Rabbiga,
taasoo ah aarsashadii macbudkiisa. 12 Kor u qaada calan
ku col ah derbiyada Baabuloon, oo ilaalladana sii xoogeeya,
oo waardiyayaasha taaga, oo gaadmada diyaariya, waayo,
Rabbigu wuxuu u qasdiyey oo weliba sameeyey waxyaalihii
uu kaga hadlay kuwa Baabuloon deggan. 13 Taadan biyaha
badan ag deggan oo khasnadaha badanay, dhammaadkaagii
waa yimid iyo qiyaastii faa'iidadaada xaqdarrada ahu. 14
Rabbiga ciidammadu wuxuu ku dhaartay nafsaddiisa, oo
wuxuu yidhi, Sida xaqiiqada ah waxaan kaa buuxin doonaa
rag sida koronkorro u faro badan, oo iyana way kugu qaylin
doonaan. 15 Isagu dhulka xooggiisuu ku sameeyey, dunidana
xigmaddiisuu ku dhisay, oo samooyinkana waxgarashadiisuu
ku kala bixiyey. 16 Markuu codkiisa ku hadlo biyo badan
guuxooda baa samooyinka laga maqlaa, oo isagaa ka dhiga
in dhulka darafyadiisa uumi ka soo kaco, roobkana wuxuu
u sameeyaa hillaac, oo dabayshana isagaa khasnadihiisa
ka soo saara. 17 Nin kastaaba wuxuu noqday doqon
aan aqoon lahayn, oo dahabshube kastaaba wuxuu ku
ceeboobay sanamkiisii la xardhay, waayo, sanamkiisii la
shubay waa been oo innaba neef ma leh. 18 Iyagu waa
wax aan waxtar lahayn iyo shuqul lagu majaajilowdo, oo
wakhtiga ciqaabiddoodana way wada baabbi'i doonaan. 19
Kan Yacquub qaybta u ah iyaga la mid ma aha, waayo,
isagu waa kan wax kasta abuuray, oo reer binu Israa'iilna
waa qoladii dhaxalkiisa, oo magiciisuna waa Rabbiga
ciidammada. 20 Adigu waxaad ii tahay dubbahaygii iyo
hubkaygii dagaalka, oo adigaan quruumaha kugu burburin
doonaa, oo adigaan boqortooyooyin kugu baabbi'in doonaa.
21 Oo adigaan kugu burburin doonaa faraska iyo kan
fuushanba, oo adigaan kugu burburin doonaa gaadhifaraska
iyo kan fuushanba, 22 oo weliba adigaan kugu burburin
doonaa ragga iyo dumarkaba, oo adigaan kugu burburin
doonaa odayga iyo barbaarkaba, oo adigaan kugu burburin
doonaa wiilka iyo gabadhaba, 23 oo weliba adigaan kugu
burburin doonaa adhijirka iyo adhigiisaba, oo adigaan kugu
burburin doonaa ninkii beerrey ah iyo dibidiisba, oo adigaan
kugu burburin doonaa taliyayaasha iyo saraakiishaba. 24
Oo Rabbigu wuxuu leeyahay, Baabuloon iyo dalka Kalday
dadka deggan oo dhanba waxaan ka abaalmarin doonaa
sharkii ay Siyoon iyo adiga hortaadaba ku sameeyeen.
25 Buurta wax baabbi'isa oo dunida oo dhan halligaysay,
Rabbigu wuxuu leeyahay, Bal eeg, anigu col baan kugu
ahay, oo gacantaydaan kugu dul fidin doonaa, oo waxaan
hoos kaga soo giringirin doonaa dhagaxyada dushooda, oo
waxaan kaa dhigi doonaa buur gubatay. 26 Rabbigu wuxuu
leeyahay, Lagaama qaadan doono dhagax rukun noqon
kara iyo dhagax aasaas noqon kara toona, laakiinse adigu
weligaaba cidla baad ahaan doontaa. 27 Dalka calan ka
dhex taaga, oo quruumahana buunka ka dhex yeedhiya, oo
quruumaha u soo wada diyaariya, inay iyada ku kacaan, oo
waxaad u wada yeedhaan boqortooyooyinka Araarad, iyo

Minnii, iyo Ashkenas inay ku kacaan, oo sirkaal iyada col
ku ah doorta, oo fardahana ugu sii daaya sida koronkorro
baas oo kale. 28 Oo waxaad iyada u soo diyaarisaan
quruumaha, iyo boqorrada reer Maaday, iyo taliyayaashooda
iyo saraakiishooda oo dhan, iyo dalka taliskiisa ku jira oo
dhanba. 29 Dalku wuu gariiraa, wuuna xanuunsadaa, waayo,
qasdi kasta oo Rabbigu uu Baabuloon ugu qasdiyeyba
waa la oofiyaa si uu dalka Baabuloon uga dhigo cidla
aan ciduna degganayn. 30 Raggii xoogga badnaa ee
Baabuloon dagaalkay ka joogsadeen, oo waxay ku hadheen
qalcadahoodii. Way taag gabeen, oo waxay noqdeen sidii
naago oo kale. Meelaheedii lagu hoyan jiray way gubeen, oo
qataarradeediina way kala jabeen. 31 Wargeeysba wargeeys
buu ku orday, oo farriinqaadeba farriinqaaduu ku orday
inuu boqorka Baabuloon u sheego in magaaladiisii dhan
kasta laga qabsaday, 32 oo meelihii webiga laga gudbi
jirayna la wada xidhay, oo cawsduurkiina dab lagu gubay, oo
raggii dagaalkuna ay wada cabsadeen. 33 Waayo, Rabbiga
ciidammada oo ah Ilaaha reer binu Israa'iil wuxuu leeyahay,
Dadka Baabuloon waa sidii meel hadhuudh lagu tumo, oo
haatan waa wakhtigii la tumi lahaa, in yar dabadeedna waxaa
u iman doona wakhtigii beergoosashada. 34 Nebukadresar oo
ah boqorka Baabuloon ayaa i baabbi'iyey, wuu i burbursaday,
oo weel madhan buu iga dhigay, wuuna i liqay sidii bahal weyn
oo kale, oo wuxuu calooshiisa ka buuxsaday cuntadaydii
macaanayd, oo dibadduu ii xooray. 35 Kan Siyoon degganu
wuxuu odhan doonaa, Dulmigii aniga iyo jidhkayga lagu
sameeyey Baabuloon ha saarnaado. Yeruusaalem waxay
odhan doontaa, Dhiiggaygu dadka dalka Kalday deggan ha
saarnaado. 36 Sidaas daraaddeed Rabbigu wuxuu leeyahay,
Bal ogow, anigu dacwadaada waan kuu qaadi doonaa,
waanan kuu aari doonaa, oo baddeeda waan engejin doonaa,
oo isheedana waan qallajin doonaa. 37 Baabuloon waxay
noqon doontaa tuulmooyin burbur ah iyo meel dawacooyinku
ay ku hoydaan, iyo wax laga yaabo oo lagu foodhyo, oo
aan ciduna degganayn. 38 Iyagu dhammaantood waxay
u ciyi doonaan sida libaaxyo aaran ah oo kale, oo waxay
u guuxi doonaan sida dhal libaax oo kale. 39 Rabbigu
wuxuu leeyahay, Markay kululaadaan ayaan diyaafad u
samayn doonaa, oo waan wada sakhraamin doonaa si ay u
reyreeyaan oo ay u seexdaan hurdo weligeed ah oo ayan ka
soo toosin. 40 Oo waxaan iyaga u soo kaxayn doonaa sida
baraar la gowracayo iyo sida wanan iyo orgiyo oo kale. 41
Sidee baa Sheeshag loo qabsaday, sidee baa ammaantii
dunida oo dhan loo argaggixiyey, oo sidee baa Baabuloon
ay wax laga yaabo quruumaha dhexdooda ugu noqotay!
42 Baabuloon baddii baa ku soo kor butaacday, oo waxaa
qarqiyey hirarkeedii badnaa. 43 Magaalooyinkeedii waxay
noqdeen cidla iyo dhul engegan, iyo lamadegaan, iyo dal
aan ciduna degganayn, ama aan binu-aadmi innaba soo ag
marin. 44 Oo Beelna waxaan ku ciqaabi doonaa Baabuloon
dhexdeeda, oo waxaan afkiisa ka soo bixin doonaa wixii uu
liqay, oo quruumuhuna innaba mar dambe isaga uma ay
soo qulquli doonaan, hubaal, derbiga Baabuloon wuu dumi
doonaa. 45 Dadkaygiiyow, iyada ka dhex baxa, oo ninkiin
kastaaba naftiisa ha kala baxsado Rabbiga cadhadiisa kulul.
46 Ha qalbi jebin, hana ka cabsan warka belefta ah ee dalka
laga dhex maqli doono, waayo, sannad war baa iman doona
oo haddana sannadda kalena war kalaa iman doona, oo
dalka dhexdiisa waxaa jiri doona dulmi, oo taliyeba taliyuu
ku kici doonaa. 47 Sidaas daraaddeed waxaa iman doona
wakhti aan xukun ku soo dejin doono sanamyada xardhan
ee Baabuloon, oo dalkeeda oo dhammuna wuu ceeboobi
doonaa, oo kuweeda la laayay oo dhammuna iyaday ku
dhex dhici doonaan. 48 Rabbigu wuxuu leeyahay, Markaasay
samada iyo dhulka iyo waxa ku jira oo dhammuba farxad ku
heesi doonaan Baabuloon aawadeed, waayo, kuwa iyada
baabbi'in doona ayaa xagga woqooyi uga iman doona.
49 Baabuloon sidii ay u daadisay kuwii reer binu Israa'iil
laga laayay, sidaas oo kale ayaa Baabuloon waxaa ugu
dhex daadan doona kuwa dhulka laga laayay oo dhan. 50
Kuwiinna seefta ka baxsadayow, taga, oo ha joogsanina.
Rabbiga meel fog ka soo xusuusta, oo Yeruusaalemna
maankiinna ha soo gasho. 51 Annagu waannu ceeboonnay,
maxaa yeelay, waxaannu maqalnay cay xun, oo ceeb baa
wejigayagii qarisay, waayo, shisheeyayaal ayaa meelaha
quduuska ah ee guriga Rabbiga soo dhex galay. 52 Rabbigu
wuxuu leeyahay, Sidaas daraaddeed waxaa iman doona
wakhti aan xukun ku soo dejin doono sanamyadeeda
xardhan, oo dalkeeda oo dhanna dadka dhaawaca ah
baa ka dhex taahi doona. 53 Rabbigu wuxuu leeyahay,
Baabuloon in kastoo ay tan iyo samada korto, iyo in kastoo
ay meelaheeda dhaadheer ee xoogga badan sii adkayso,
kolleyba waxaa iyada u tegi doona baabbi'iyayaal iga yimid.
54 Baabuloon qaylaa ka yeedhaysa, oo dalka reer Kaldayiinna
baabba' weyn baa ka dhex sanqadhayaa, 55 maxaa yeelay,
Rabbigu Baabuloon wuu baabbi'iyaa, oo codkii weynaana
dhexdeeda wuu ka aamusiiyaa, oo mawjadahoodu way u
guuxaan sida biyo badan, qaylada codkoodana kor bay
u qaadaan, 56 maxaa yeelay, waxaa Baabuloon ku soo
degay baabbi'iyihii, oo raggeedii xogga badanna waa la
qabtay, oo qaansooyinkoodiina way jabeen, waayo, Rabbigu
waa Ilaahii abaalmarinta, oo sida xaqiiqada ah isagu wuu
u abaalgudi doonaa. 57 Oo waxaan wada sakhraamin

doonaa amiirradeeda, iyo raggeeda xigmadda leh, iyo
taliyayaasheeda, iyo saraakiisheeda, iyo raggeeda xoogga
badanba, oo waxay seexan doonaan hurdo weligeed ah, oo
ayan ka soo toosin, ayaa Boqorka magiciisa la yidhaahdo
Rabbiga ciidammadu leeyahay. **58** Rabbiga ciidammadu
wuxuu leeyahay, Derbiyada balballaadhan ee Baabuloon
waa la wada dumin doonaa, oo irdaheeda dhaadheerna
dab baa lagu gubi doonaa, oo dadku waxtarla'aan buu u
hawshoon doonaa, quruumuhuna dab, wayna daali doonaan.
**59** Kanu waa eraygii Nebi Yeremyaah uu ku amray Seraayaah
ina Neeriiyaah oo ahaa ina Maxseeyaah markuu Baabuloon
u raacay Sidqiyaah oo ahaa boqorkii dalka Yahuudah
sannaddii afraad ee boqornimadiisa. Seraayaah wuxuu
ahaa amiirkii reer boqor maamulaha u ahaa. **60** Markaas
Yeremyaah kitaab buu ku qoray masiibadii Baabuloon ku
soo degi lahayd oo dhan, waana erayadan Baabuloon ku
saabsan ee uu qoray. **61** Oo Yeremyaah wuxuu Seraayaah
ku yidhi, Markaad Baabuloon tagtid oo aad aragtid, erayadan
oo dhan wada akhri, **62** oo markaas waxaad tidhaahdaa,
Rabbiyow, adigu waxaad ka hadashay meeshan inaad
baabbi'inaysid, si aan waxba gudaheeda ugu hadhin dad iyo
duunyo toona, laakiinse ay weligeedba cidla ahaan doonto.
**63** Oo markaad kitaabkan akhrintiisa dhammaysid waa inaad
isaga dhagax ku xidhaa oo aad Webi Yufraad dhexdiisa ku
tuurtaa. **64** Oo waxaad tidhaahdaa, Baabuloon sidaasay u
tiimban doontaa, oo kamana soo sara kici doonto masiibada
aan iyada ku soo dejin doono aawadeed, oo iyagu way daali
doonaan. Intaasu waa erayadii Yeremyaah.

**52** Sidqiyaah markuu boqor noqday wuxuu jiray kow
iyo labaatan sannadood, oo Yeruusaalemna wuxuu
boqor ku ahaa kow iyo toban sannadood. Oo hooyadiis
magaceeduna wuxuu ahaa Xamuutal ina Yeremyaah oo reer
Libnaah ahayd. **2** Oo isagu wuxuu sameeyey wax Rabbiga
hortiisa shar ku ah sidii wixii Yehooyaaqiim sameeyey oo
dhan. **3** Oo tanu waxay Yeruusaalem iyo dalka Yahuudah
ugu dhacday cadhadii Rabbiga aawadeed ilaa uu hortiisa
ka tuuray, kolkaasaa Sidqiyaahna ka fallaagoobay boqorkii
Baabuloon. **4** Oo sannaddii sagaalaad oo boqornimadiisa,
bishii tobnaad, maalintii tobnaad ayaa Nebukadresar oo
ahaa boqorkii Baabuloon iyo ciidankiisii Yeruusaalem ku
keceen, oo intay hor degeen ayay qalcado hareereheeda ka
dhisteen. **5** Oo sidaasay magaaladii u hareeraysnayd tan iyo
sannaddii kow iyo tobnaad oo Boqor Sidqiyaah. **6** Oo maalintii
sagaalaad, bishii afraad, ayaa abaartii magaaladii aad iyo
aad ugu xumaatay, oo sidaas daraaddeed dadkii dalka
degganaa cunto ma haysan. **7** Markaasaa meel magaalada
ahayd la jebiyey, oo raggii dagaalka oo dhammuna way
carareen, oo waxay goor habeennimo ah magaaladii kaga
bexeen iriddii labada derbi u dhaxaysay oo beertii boqorka ku
ag tiil (haddaba reer Kaldayiin waxay ku wareegsanaayeen
magaalada). Oo waxay mareen jidkii Caraabaah. **8** Laakiinse
ciidankii reer Kaldayiin ayaa boqorkii eryaday, oo waxay
Sidqiyaah ku gaadheen bannaannadii Yerixoo, oo ciidankiisii
oo dhammuna way ka kala firdheen. **9** Markaasay boqorkii
qabsadeen oo boqorkii Baabuloon ugu geeyeen Riblaah
oo ku tiil dalka Xamaad, wuuna xukumay. **10** Oo boqorkii
Baabuloon Sidqiyaah wiilashiisii hortiisuu ku laayay, oo
weliba amiirradii dalka Yahuudah oo dhanna wuxuu ku
wada laayay Riblaah. **11** Oo weliba Sidqiyaahna indhihii
buu ka riday, oo boqorkii Baabuloon wuxuu ku xidhxidhay
silsilado oo wuxuu u kaxaystay Baabuloon, oo xabsi buu
ku riday ilaa maalintii dhimashadiisa. **12** Haddaba bishii
shanaad maalinteedii tobnaad oo ahayd sannaddii sagaal iyo
tobnaad oo Nebukadresar boqorkii Baabuloon ahaa waxaa
Yeruusaalem yimid Nebuusaradaan oo ahaa sirkaalkii askarta
oo boqorka Baabuloon u adeegi jiray. **13** Markaasuu gubay
gurigii Rabbiga iyo gurigii boqorka, oo wuxuu kaloo gubay
guryihii Yeruusaalem oo dhan, kuwaasoo ahaa guri kasta oo
weyn. **14** Oo ciidankii reer Kaldayiin oo sirkaalkii askarta la
socday oo dhammuna waxay wada dumiyeen derbiyadii
Yeruusaalem ku wareegsanaa oo dhan. **15** Markaasaa
Nebuusaradaan oo ahaa sirkaalkii askartu wuxuu maxaabiis
ahaan u kaxaystay masaakiintii dadka qaarkood, iyo dadkii
magaalada ku hadhay, iyo kuwii cararay oo u galay boqorkii
Baabuloon, iyo intii dadkii faraha badnaa ka hadhay. **16**
Laakiinse Nebuusaradaan oo sirkaalkii askarta ahaa wuxuu
ka tegey dadkii waddanka ugu liitay inay ahaadaan kuwa
canabka iyo beeraha kale ka shaqeeya. **17** Markaasaa reer
Kaldayiin waxay jejebiyeen tiirarkii naxaasta ahaa oo guriga
Rabbiga ku jiray, iyo saldhigyadii iyo berkeddii naxaasta
ahayd oo guriga Rabbiga ku jiray, oo naxaastoodiina waxay u
qaadeen Baabuloon. **18** Oo waxay kaloo qaadeen dheryihii,
iyo majarafadihii, iyo alaabtii laambadihii lagu safayn jiray, iyo
maddiibadihii, iyo malgacadihii, iyo weelashii naxaasta ahaa
oo lagu adeegi jiray oo dhan. **19** Oo sirkaalkii askartu wuxuu
la tegey suxuuntii, iyo dabqaadayaashii, iyo maddiibadihii, iyo
dheryihii, iyo laambadihii, iyo malgacadihii, iyo koobabkiiba,
intii dahabka ahayd dahab ahaan buu u qaaday, oo intii
lacagta ahaydna lacag ahaan. **20** Labadii tiir, iyo berkeddii,
iyo laba iyo tobankii dibi oo naxaasta ahaa oo saldhigyada
ka hooseeyey, oo Boqor Sulaymaan uu u sameeyey gurigii
Rabbiga, dhammaan weelashaas naxaastoodu miisaan
ma lahayn. **21** Oo tiirarka midkood sarajooggiisu wuxuu
ahaa siddeed iyo toban dhudhun, meeriskiisuna wuxuu

ahaa laba iyo toban dhudhun markii xadhig lagu qiyaaso,
oo dhumucdiisuna waxay ahayd afar farood, oo dhexdana
wuu ka dalooshanaa. 22 Oo korkiisana waxaa saarnaa taaj
naxaas ah, oo taajka sarajooggiisuna wuxuu ahaa shan
dhudhun, wuxuuna lahaa shabag iyo rummaanno taajka
ku wareegsan, oo kulligoodna waxay ahaayeen naxaas,
tiirkii labaadna waxan oo kaluu lahaa iyo rummaanno. 23 Oo
dhinacyada waxaa ku yiil lix iyo sagaashan rummaan, oo
rummaannadii shabagga ku wareegsanaa oo dhammuna
waxay ahaayeen boqol. 24 Oo sirkaalkii askartu wuxuu
kaloo kaxaystay Seraayaah oo ahaa wadaadkii sare, iyo
Sefanyaah oo ahaa wadaadkii labaad, iyo saddexdii iridjoog.
25 Oo wuxuu magaaladii kala soo baxay sirkaal u sarreeyey
raggii dagaalyahanka ahaa, iyo toddoba nin oo ka mid
ahaa kuwii boqorka hor joogi jiray oo magaaladii laga dhex
helay, iyo karraanigii sirkaalka ciidanka ee ururin jiray dadkii
waddanka, iyo lixdan nin oo ahaa dadkii dalka degganaa oo
magaaladii laga dhex helay. 26 Markaasaa Nebuusaradaan
oo ahaa sirkaalkii askartu iyagii kexeeyey oo Riblaah
ugu geeyey boqorkii Baabuloon. 27 Markaasaa boqorkii
Baabuloon iyagii ku laayay Riblaah oo ku taal dalka Xamaad.
Oo sidaasaa dadkii Yahuudah dalkoodii looga kaxaystay
iyagoo maxaabiis ah. 28 Oo sannaddii toddobaad dadkii
uu Boqor Nebukadresar maxaabiisahaanta u kaxaystay
waxay ahaayeen saddex kun iyo saddex iyo labaatan qof oo
Yuhuud ah, 29 oo sannaddii siddeed iyo tobnaad oo Boqor
Nebukadresarna wuxuu Yeruusaalem maxaabiis ahaan uga
kaxaystay siddeed boqol iyo laba iyo soddon qof. 30 Oo
sannaddii saddex iyo labaatanaad oo Boqor Nebukadresarna
Nebuusaradaan oo ahaa sirkaalkii askarta ayaa Yuhuuddii
maxaabiis ahaan uga kaxaystay toddoba boqol iyo shan iyo
afartan qof, oo dadkii la kaxaystay oo dhammuna waxay
ahaayeen afar kun iyo lix boqol oo qof. 31 Oo sannaddii
toddoba iyo soddonaad intii boqorkii dalka Yahuudah oo
Yehooyaakiin ahaa uu xidhnaa, bishii laba iyo tobnaad,
maalinteedii shan iyo labaatanaad Ewiil Merodag oo ahaa
boqorkii Baabuloon sannaddii uu boqor noqday ayuu sara u
qaaday Yehooyaakiin oo ahaa boqorkii dalka Yahuudah, oo
xabsiguu ka soo bixiyey. 32 Oo si roon buu ula hadlay, oo
wuxuu carshigiisii ka kor mariyey carshigii boqorradii isagii
Baabuloon la joogay. 33 Oo dharkiisii xabsiga ayuu beddelay
oo hortiisuu wax ku cuni jiray had iyo jeerba cimrigiisii oo
dhanba. 34 Oo xagga masruufkiisana boqorkii Baabuloon
xaggiisa waxaa laga siin jiray masruuf joogta ah, oo tan
iyo maalintii uu dhintay maalin kastaba qayb buu heli jiray
cimrigiisii oo dhan.

# Baroorashadii Yeremyaah

1 Magaaladii dadku ka buuxay sidee bay keligeed u
fadhiisataa! Sidee bay carmal oo kale u noqotay!
Tii quruumaha dhexdooda ku weynayd, oo dalalka
gobolladooda amiirad ku ahayd Sidee bay addoon u
noqotay! 2 Habeenkii aad bay u ooydaa, oo ilmadeediina
dhabannaday kaga taal. Kuwii jeclaa oo dhan iyadu
kama haysato mid u qalbi qaboojiya. Saaxiibbadeedii oo
dhammu way wada khiyaaneeyeen, Oo waxay noqdeen
cadaawayaasheedii. 3 Quruunta Yahuudah maxaabiis ahaan
baa loo kaxaystay dhibkeedii iyo addoonsigeedii weynaa
aawadood. Quruumahay dhex deggan tahay, oo innaba
nasasho ma hesho. Silciyayaasheedii oo dhammu waxay
soo gaadheen iyadoo cidhiidhi ku dhex jirta. 4 Jidadkii Siyoon
way baroortaan, maxaa yeelay, ninna iidaha uma yimaado.
Irdaheedii oo dhammu waa cidla, wadaaddadeeduna
way wada taahaan, Hablaheeda bikradaha ahuna way
dhibaataysan yihiin, oo iyada qudheedana dhib qadhaadh
baa haya. 5 Kuwii cidhiidhin jiray madax bay noqdeen,
cadaawayaasheediina way barwaaqoobaan, Waayo, Rabbigu
wuxuu iyada u dhibay xadgudubyadeedii badnaa aawadood.
Carruurteediina maxaabiis ahaan bay cadowgoodii u hor
socdeen. 6 Oo magaaladii Siyoon quruxdeedii oo dhammuna
way ka dhammaatay. Amiirradeedii waxay noqdeen sidii
deero daaq weyday, Oo waxay tageen iyagoo aan itaal
ku lahayn kan eryanaya hortiis. 7 Yeruusaalem wakhtiga
ay dhib iyo wareeg ku jirto ayay waxay soo xusuusataa
Waxyaalihii wanaagsanaa oo ay waagii hore haysatay oo
dhan. Markii dadkeedu gacanta cadowga ku dhacay, oo
aan ninna caawiyin Ayaa cadaawayaashu iyada arkeen,
oo baabba'eedana way ku majaajiloodeen. 8 Yeruusaalem
aad iyo aad bay u dembaabtay, oo sidaas daraaddeed
sida wax wasakh ah ayaa loo xooray. Intii sharfi jirtay oo
dhammu way quudhsadaan, maxaa yeelay, waxay arkeen
cawradeedii. Hubaal way taahdaa, wayna sii jeesataa. 9
Nijaasteedii waxay ku tiil googaradaheeda, kamana ay fiirsan
ugudambaysteeda, Haddaba sidaas daraaddeed si aad loola
yaabay ayay u dhacday, oo mid u qalbi qaboojiyana ma
ay lahayn. Rabbiyow, bal dhibkayga fiiri, waayo, cadowgii
wuu isweyneeyey. 10 Cadowgu wuxuu gacanta ku fidiyey
waxyaalaheedii wanaagsan oo dhan, Waayo, iyadu way
aragtay in quruumihii ay meesheedii quduuska ahayd galeen,
Kuwaasoo aad amartay inayan ururkaaga gelin. 11 Dadkeeda
oo dhammu way taahaan, oo kibis bay doondoonaan.
Waxyaalahoodii wanaagsanaa cuntay siisteen si ay nafta
ugu ceshadaan. Rabbiyow, bal eeg oo ka fiirso, waayo,
waxaan noqday wax la nacay. 12 Miyaydaan dan iga lahayn,
kuwiinna i ag marayow? Bal eega, oo fiiriya hadday jirto
murug murugtayda la mid ah ee laygu riday, Oo uu Rabbigu
igu dhibay maalintii ay cadhadiisa kululu timid. 13 Xagga
sare ayuu lafahayga uga soo daayay dab iyaga ka xoog
badnaaday. Cagahayga ayuu shabag u kala bixiyey, oo
dib buu ii celiyey. Maalintii oo dhan cidla buu iga dhigay,
wuuna i taag gabiyey. 14 Harqoodkii xadgudubyadayda
gacantiisaa xidhay. Way isku xidhan yihiin oo qoortay ii
saaran yihiin. Xooggayguu yareeyey. Sayidku wuxuu igu
riday gacmihii kuwa aanan iska daafici karin. 15 Raggaygii
xoogga badnaa oo dhan Sayidku dhexdayduu ku tuuray.
Wuxuu iigu yeedhay shir inuu barbaarradayda burburiyo.
Gabadhii bikradda ahayd ee quruunta Yahuudah ah Sayidku
wuxuu ugu tuntay sidii macsaro khamri. 16 Waxyaalahan
daraaddood ayaan la ooyayaa, oo indhahayga ilmaa ka
daadanaysa, Maxaa yeelay, kii i qalbi qaboojin lahaa oo
naftayda u raaxayn lahaa waa iga fog yahay. Carruurtaydii
way cidloobeen, maxaa yeelay, cadowgii baa iga adkaaday.
17 Siyoon gacmahay hoorsataa, mase jiro mid u qalbi
qaboojiya. Rabbigu wuxuu amray in kuwa dadka Yacquub ku
wareegsan ay cadaawayaashooda noqdaan. Yeruusaalemna
waxay dhexdooda ku tahay sida wax wasakh ah. 18 Rabbigu
waa xaq, waayo, amarkiisaan ku caasiyoobay. Dadyowga oo
dhammow, i maqla, waan idin baryayaaye, oo bal murugtayda
fiiriya. Hablahaygii bikradaha ahaa iyo barbaarradaydii
maxaabiis ahaan baa loo kaxaystay. 19 Waxaan u yeedhay
kuwii i jeclaa, laakiinse way i khiyaaneeyeen. Wadaaddadaydii
iyo duqowdaydiiba magaalada dhexdeeda ayay ku naf
bexeen, Intay doondoonayeen cunto ay nafta ku ceshadaan.
20 Rabbiyow, bal i eeg, waayo, cidhiidhi baan ku jiraa. Uurkaa
i gubanaya, Qalbigayguna wuu igu dhex rogman yahay,
waayo, aad baan u caasiyoobay. Dibadda seef baa igu
gablamisa, gurigana geeri baa ii joogta. 21 Inaan taahayo waa
la maqlay, ninnase ima qalbi qaboojiyo. Cadaawayaashaydii
oo dhammu dhibaatadaydii way maqleen, oo inaad saas
igu samaysay way ku faraxsan yihiin. Waad keeni doontaa
maalintii aad ka hadashay, oo iyaguna sidaydoo kalay
noqon doonaan. 22 Xumaantooda oo dhammu hortaada ha
timaado, Oo iyaga ku samee wixii aad xadgudubyadayda
aawadood iigu samaysay oo dhan, Waayo, taahaygu waa
badan yahay, oo qalbigaygiina wuu itaal darnaaday.

2 Sayidku sidee buu xanaaqiisii magaalada Siyoon daruur
ugu daboolay! Quruxdii dadka Israa'iilna samaduu ka soo

tuuray oo dhulkuu ku soo xooray, Oo maalintii cadhadiisa
meeshuu cagaha dhigan jiray sooma uu xusuusan. 2
Sayidku wuxuu liqay rugihii dadka Yacquub oo dhan,
umana uu tudhin. Wuxuu cadhadiisii ku dumiyey qalcadihii
dadka Yahuudah, Oo dhulkuu ku soo xooray iyagii, Oo
boqortooyadii iyo amiirradeediiba nijaas buu ku tiriyey. 3
Wuxuu cadhadiisii kululayd ku gooyay geeskii dadka Israa'iil
oo dhan. Oo gacantiisii midigna wuu ka soo ceshaday
cadowga hortiisii, Dadka Yacquubna wuxuu u gubay sidii
dab ololaya oo baabbi'iya waxaa hareerihiisa yaal oo dhan.
4 Wuxuu qaansadiisii u xootay sidii cadow oo kale, oo
gacantiisii midigna wuu u taagay sidii nacab oo kale, Oo
wixii isha u roonaa ayuu wada laayay, Oo taambuuggii
magaalada Siyoonna cadhadiisuu ugu soo daadiyey sidii
dab oo kale. 5 Sayidku wuxuu noqday sidii cadow oo kale,
oo dadka Israa'iilna wuu liqay, Daarahoodii waaweynaana
wuu wada liqay, oo qalcadahoodiina wuu wada burburiyey,
Oo dalka Yahuudahna wuxuu ku badiyey baroor iyo oohin. 6
Taambuuggiisii wuxuu u dumiyey sidii waab beer ku yaal,
Oo meeshii shirkiisana wuu baabbi'iyey. Rabbigu wuxuu
ka dhigay in Siyoon lagu dhex illoobo iiddii iyo sabtidiiba,
Oo dhirifkii cadhadiisa ayuu ku quudhsaday boqorkii iyo
wadaadkiiba. 7 Sayidku wuu xooray meeshiisii allabariga,
oo meeshiisii quduuska ahaydna wuu karhay, Derbiyadii
daaraheeda waaweynna gacanta cadowga buu u geliyey. Oo
gurigii Rabbigana way ku dhex qayliyeen sidii maalin iid ah. 8
Rabbigu wuu u qasdiyey inuu baabbi'iyo derbigii magaalada
Siyoon. Xadhig buu ku kala fidiyey, oo gacantiisiina kama
celin baabbi'inteedii. Wuxuu ka dhigay dhufays iyo derbi
inay baroortaan, oo dhammaantoodna way wada jilceen. 9
Irdaheedii dhulkay ku tiimbadeen, oo qataarradeediina wuu
wada burburiyey oo jejebiyey. Boqorkeedii iyo amiirradeediiba
waxay dhex joogaan quruumaha, sharcigiina innaba ma
jiro, Oo nebiyadeediina xagga Rabbiga waxba loogama
muujin. 10 Odayaashii magaalada Siyoon iyagoo aamusan
ayay dhulka fadhiyaan, Boodh bay madaxa ku shubteen, oo
waxay guntadeen joonyado. Bikradihii Yeruusaalem madaxay
dhulka ku fooroориyeen. 11 Indhahaygii ilmay la gudheen,
uurkuna waa i gubanayaa, Oo aad baan u caloolxumahay,
waayo, waxaa la baabbi'iyey dadkaygii, Maxaa yeelay,
carruurtii iyo naasonuugyadiiba jidadka magaalada bay ku
itaal darnaadaan. 12 Waxay hooyooyinkood ku yidhaahdaan,
Meeh hadhuudhkii iyo khamrigii? Iyagoo jidadka magaalada
ku itaaldaran sida dad dhaawac ah oo kale, Markii ay
naftoodu kaga baxayso laabta hooyooyinkood. 13 Magaalada
Yeruusaalemay, maxaan kuu maragfuraa? Maxaanse kuu
ekaysiiyaa? Magaalada Siyoonay, bal maxaan kaala mid
dhigaa si aan kuugu qalbi qabowjiyo? Waayo, jabkaagu
wuxuu u weyn yahay sida badda oo kale. Bal yaa ku bogsiin
kara? 14 Nebiyadaadii waxay arkeen waxyaalo aan waxtar
lahayn oo doqonnimo ah, Oo xumaantaadiina daaha sow
kama ay qaadin si maxaabiistaadii laguugu soo celiyo,
Laakiinse waxay kuu arkeen waxyaalo aan waxtar lahayn
oo ku leexiya. 15 Waxa ag mara oo dhammu way kugu
sacbiyaan, Wayna ku foodhyaan oo ay madaxa ku lulaan
magaalada Yeruusaalem, oo waxay isku yidhaahdaan, Tanu
ma magaaladii la odhan jiray Kaamilnimada quruxda iyo
farxadda dunida oo dhan baa? 16 Cadaawayaashaadii oo
dhammu afkay kugu kala qaadeen, Intay foodhyaan oo
ilko jirriqsadaan ayay waxay yidhaahdaan, Waannu liqnay.
Sida xaqiiqada ah tanu waa maalintii aannu sugaynay,
Waannu helnay oo waannu aragnay. 17 Rabbigu wuu
sameeyey wixii uu ku talaggalay, Oo eraygiisii uu waagii
hore amrayna wuu oofiyey. Wuu dumiyey, umana uu tudhin.
Oo wuxuu ka dhigay in cadowgu kugu reyreeyo, Oo geeskii
cadaawayaashaadana kor buu u taagay. 18 Qalbigoodii
Sayidkuu ugu qayliyey. Derbiga magaalada Siyoonow,
habeen iyo maalinba ilmadaadu ha u qulqusho sida webi
oo kale. Nafsaddaada nasasho ha siin, oo yaan ishaadu
joogsan. 19 Sara joogso, oo habeenkii gelinkiisa hore
qayli. Qalbigaaga sida biyo oo kale Sayidka hortiisa ugu
daadi. Gacmaha xaggiisa ugu hoorso carruurtaada yaryar
naftooda aawadeed, Kuwaasoo jid kasta rukunkiisa gaajo
ugu itaaldaran. 20 Rabbiyow, bal eeg, oo ka fiirso kan aad
waxan ku samaysay! Naaguhu ma inay midhaha maxalkooda
oo ah carruurtii ay koolkooliyeen cunaan baa? Wadaadka
iyo nebiga ma in meesha quduuska ah ee Sayidka lagu
dilaa baa? 21 Yar iyo weyn baa dhulkay jiifaan jidadka
dhexdooda, Hablahaygii iyo barbaarradaydiiba seef baa
lagu laayay. Waxaad iyaga laysay maalintii cadhadaada,
waad gowracday oo uma aad tudhin. 22 Sidii maalin ciid
ah oo kale ayaad dhinac kasta iigaga yeedhay kuwii aan
ka cabsan jiray, Oo maalinta cadhada Rabbiga midna ma
baxsan mana hadhin, Kuwii aan koolkooliyey oo aan koriyey
cadowgaygaa baabbi'iyey.

3 Anigu waxaan ahay ninkii arkay dhibaatadii ay ushii
cadhadiisu keentay. 2 Wuu i hoggaamiyey oo igu dhex
socodsiiyey gudcur aan iftiin lahayn. 3 Sida xaqiiqada ah
maalintii oo dhan ayuu mar kasta gacantiisa igu sii jeediyaa.
4 Jiidhkaygii iyo haraggaygiiba wuu gaboojiyey, lafahaygiina
wuu jejebiyey. 5 Wax buu igu wareejiyey, oo wuxuu igu
hareereeyey qadhaadh iyo dhib. 6 Wuxuu iga dhigay inaan
meelo gudcur ah dego sidii kuwii waagii hore dhintay. 7 Derbi

buu igu wareejiyey si aanan u bixi karin, silsiladdaydiina
mid culus buu ka dhigay. 8 Oo weliba markaan dhawaaqo
oo aan caawimaad u qayshadona baryadayda wuu diidaa.
9 Jidadkaygii wuxuu ku awday dhagaxyo la qoray, oo
wadiiqooyinkaygiina wuu qallooociyey. 10 Wuxuu igu noqday
sidii orso ii gabbanaysa iyo sidii libaax meelo qarsoon iigu
dhuumanaya. 11 Jidadkaygii wuu iga leexiyey, oo cad cad
buu ii kala jaray, cidla buuna iga dhigay. 12 Qaansadiisii
wuu xootay, oo wuxuu iga dhigay goolibaadhkii fallaadha.
13 Isagu wuxuu ka dhigay fallaadhihii gabooyihiisu inay
kelyahayga galaan. 14 Waxaan dadkaygii oo dhan u noqday
wax la quudhsado, oo maalintii oo dhanna gabaygooda way
igu halqabsadaan. 15 Wuxuu iga buuxiyey qadhaadh, dacar
buuna igu dhergiyey. 16 Ilkahaygii dhagaxyo quruurux ah
ayuu ku jejebiyey, oo dambas buu igu daboolay. 17 Naftaydii
nabad waad ka fogaysay, oo barwaaqo iyo wanaag waan
illoobay. 18 Waxaan is-idhi, Xooggaygii iyo rajadaydiiba
xagga Rabbiga way ka baabbe'een. 19 Xusuuso dhibkaygii
iyo wareeggaygii, iyo dacartii iyo xammeetidii. 20 Naftaydu
iyagay weli soo xusuusataa, oo ceeb bay la foororsatay. 21
Tan uun baan garwaaqsan ahay, sidaas daraaddeed rajaan
leeyahay. 22 Rabbiga naxariistiisa aawadeed ayaan laynoo
baabbi'in, maxaa yeelay, raxmaddiisu ma dhammaato. 23
Subax walba way cusub yihiin, daacadnimadaaduna way
weyn tahay. 24 Naftaydu waxay tidhaahdaa, Rabbigu waa
qaybtaydii, sidaas daraaddeed isagaan rajo ku qabi doonaa.
25 Rabbigu waa u roon yahay kuwa isaga rajo ku suga
iyo naftii isaga doondoontaba. 26 Waxaa wanaagsan in
badbaadinta Rabbiga rajo iyo aamusnaan lagu sugo. 27
Waxaa wanaagsan in nin harqoodka qaato intuu dhallinyar
yahay. 28 Keligiis ha fadhiisto isagoo aamusan, maxaa
yeelay, isagaa kor saaray. 29 Afkiisa ciidda ha daro, waxaa
suurtowda inay rajo jirto. 30 Dhabankiisa ha u dhiibo mid
dharbaaxa, oo cay ha ka dhergo. 31 Waayo, Sayidku ilaa
weligiis ma uu sii tuuri doono. 32 Maxaa yeelay, inkastoo uu
murugeeyo, haddana weli wuu ugu nixi doonaa naxariistiisa
badnaanteeda aawadeed. 33 Waayo, isagu binu-aadmiga
kas uma dhibo, umana murugeeyo. 34 In maxaabiista dunida
oo dhan cagaha hoostooda lagu burburiyo, 35 Iyo in dadka
xaqiisa laga leexiyo Ilaaha sare hortiisa, 36 Iyo in nin gartiisa
laga qallooociyo, Sayidku raalli kama aha. 37 Waa kee kan
wax odhanaya oo ay noqdaan, Sayidkoo aan amrin? 38
Kan ugu sarreeya afkiisa sow kama soo baxaan belaayo
iyo wanaagba? 39 Bal maxaa nin noolu u cabtaa, maxaase
nin ciqaabta dembigiisa uga cabtaa? 40 Jidadkeenna aynu
baadhno, oo aynu tijaabinno, oo aynu mar kale Rabbiga u
soo noqonno. 41 Qalbigeenna iyo gacmaheenna aynu kor
ugu taagno Ilaaha samooyinka ku jira. 42 Annagu waannu
xadgudubnay oo waannu caasiyownay, oo adiguna nama
aad saamixin. 43 Cadho baad isku dabooshay, waanad na
eryatay, waad na dishay, oo noomana aadan tudhin. 44
Daruur baad isku dabooshay si aan baryona kuugu soo
gudbin. 45 Waxaad dadyowga dhexdooda naga dhigtay
uskag iyo wax la nacay. 46 Cadaawayaashayadii oo dhammu
afkay nagu kala qaadeen. 47 Waxaa noo yimid cabsi iyo
yamays, iyo halligaad iyo baabbi'in. 48 Indhahayga waxaa
ka daata durdurro ilmo ah, waana baabbi'inta dadkayga
aawadeed. 49 Indhahaygu had iyo goorba way qubtaan oo
innaba ma joogsadaan 50 Ilamaa Rabbigu hoos soo fiiriyo, oo
uu samada ka soo eego. 51 Indhahaygu way ii murugeeyaan
gabdhaha magaaladayda oo dhan daraaddood. 52 Kuwii
cadaawayaashayda sababla'aan u ahaa ayaa i ugaadhsaday
sida shimbir loo ugaadhsado oo kale. 53 Waxay bohol iigu
rideen si ay naftayda iiga qaadaan, oo dhagax bay igu
soo kor tuureen. 54 Madaxaygii biyaa ku kor daatay, oo
waxaan is-idhi, Waad go'day. 55 Rabbiyow, anigoo godka
ugu dheer ku dhex jira ayaan magacaaga ku baryootamay.
56 Codkaygii waad maqashay, bal dhegtaada ha ka xidhin
neefsashadayda iyo baryadayda. 57 Maalintii aan ku baryay
ayaad ii soo dhowaatay, oo waxaad igu tidhi, Ha cabsan.
58 Sayidow, naftayda dacwooyinkeeda waad ii qaadday,
waadna i madaxfuratay. 59 Rabbiyow, gardarradii laygu
hayay waad aragtay ee ii garsoor. 60 Aarsashadoodii
oo dhan iyo wixii ay iigu fikireen oo dhanba waad wada
aragtay. 61 Rabbiyow, waad maqashay caydoodii oo dhan
iyo wixii ay iigu fikireen oo dhan, 62 Iyo wixii kuwa igu
kacay bushimahoodii lahaayeen, iyo wixii ay maalintii oo
dhan ii qasdiyeenba. 63 Bal eeg, markay fadhiyaan iyo
markay taagan yihiinba waxaan ahay waxay ka gabyaan. 64
Rabbiyow, waxaad iyaga siin doontaa abaalgud waafaqsan
shuqullada gacmahooda. 65 Indhala'aanta qalbiga waad siin
doontaa, inkaartaadana korkooda waad ka yeeli doontaa. 66
Cadho baad ku eryan doontaa oo samadaada hoosteeda
iyagaad ka baabbi'in doontaa.

4 Dahabkii sidee buu u dhalaal beelay! Dahabkii ugu
wada saafiyaysnaase sidee buu u beddelmay! Dhagxantii
meesha quduuska ahna waxaa lagu daadshay rukunka
jid kasta. 2 Wiilashii Siyoon ee qaaliga ahaa oo dahabka
saafiga ah la mid ahaa Sidee baa loogu tiriyey dheryo
dhoobo ah oo uu dheryasameeyuhu gacmaha ku sameeyey
oo kale! 3 Xataa dawacooyinku naasahay soo bixiyaan,
oo dhallaankooda way nuujiyaan, Laakiinse dadkaygu way
u naxariis darnaadeen sida gorayada cidlada joogta. 4
Caanonuugga carrabkiisu wuxuu dhabxanagga ugu dhegaa

oon daraaddiis Carruurta yaryaruna kibis bay baryaan,
laakiinse ciduna uma gooyso. **5** Kuwii cunto macaan cuni
jiray jidadkay ku baabba'aan. Kuwii dharka cas ku soo
korayna meesha digaday ku dhegaan. **6** Ciqaabta xumaanta
dadkaygu way ka sii weyn tahay ciqaabtii dembigii Sodom,
Taasoo daqiiqad qudha lagu afgembiyey iyadoo aan ciduna
far saarin. **7** Kuweedii ahaa Nadiir Ilaah loo soocay barafka
cad way ka sii daahirsanaayeen, oo caanahana way ka
sii caddaayeen, Oo jidhkooduna murjaanta cas wuu ka
sii guduudnaa, oo midabkooduna wuxuu ahaa sidii safayr
oo kale. **8** Jaahoodu dhuxul wuu ka sii madow yahay,
oo markay jidadka marayaanna lama garto. Haraggoodii
lafuhuu ku dhegaa oo waa engegay, oo wuxuu noqday sidii
qori oo kale. **9** Kuwa seefta lagu laayo waa ka roon yihiin
kuwa gaajada u le'da, Waayo, kuwanu way caatoobaan oo
abaar bay u bakhtiyayaan iyagoo midhihii beeraha waayay.
**10** Naagihii raxiimka ahaa gacmahoodii waxay kariyeen
carruurtoodii, Oo waxay iyagu u noqdeen cuntadoodii markii
la baabbi'iyey dadkayga. **11** Rabbigu cadhadiisii buu sii
daayay, oo xanaaqiisii kululaa wuu daadiyey. Siyoonna dab
buu ka dhex shiday oo aasaaskeedii wuu baabbi'iyey. **12**
Boqorrada dhulka iyo dadka dunida deggan oo dhammuba
ma ay rumaysteen In cadowga iyo nacabku ay irdaha
Yeruusaalem geli doonaan. **13** Sababteeduna waxay ahayd
dembiyadii nebiyadeeda iyo xumaatooyinkii wadaaddadeeda
Kuwaasoo dhexdeeda dhiiggii kuwa xaqa ah ku daadshay.
**14** Sidii iyagoo indha la' ayay jidadka iska daba wareegaan
oo dhiig bay ku nijaasaysan yihiin, Sidaas daraaddeed
dharkooda lama taaban karo. **15** Waxaa iyaga loogu
qayliyey, War taga, nijaas yahay! Taga, taga, oo hana
taabanina. Markay carareen oo ay iska daba wareegeen
ayaa quruumaha waxaa laga dhex yidhi, Iyagu halkan
innaba sii degganaan maayaan. **16** Rabbigu cadhadiisuu
ku kala firdhiyey, oo mar dambe fiiro u lahaan maayo.
Wadaaddadii lama sharfin, oo odayaashiina looma nixin. **17**
Intaannu waxtarla'aan caawimaad u fiirinaynay ayaa indhihii
na daaleen. Quruuntii aannu fiirinaynay waxay ahayd quruun
aan na badbaadin karin. **18** Way na raadraadiyaan, oo
jidadkayagana ma mari karno. Ugudambaystayadii way
soo dhowaatay. Cimrigayagii wuu dhammaaday, waayo,
ugudambaystayadii way timid. **19** Kuwii na eryanayay
gorgorka samada way ka sii dheereeyeen. Waxay nagu
eryadeen buuraha dushooda, oo cidlada dhexdeeda way
noogu gabbadeen. **20** Kii sankayaga neefta u ahaa oo ahaa
kii Rabbigu subkay ayaa godadkoodii lagu qabtay, Kaasoo
aannu nidhi, Quruumaha dhexdooda ayaannu hooskiisa
ku sii degganaanaynaa. **21** Reer Edom oo dalka Cuus
degganow, farax oo reyree. Koobku adiguu kuu soo gudbi
doonaa, waanad sakhraami doontaa, oo waad isqaawin
doontaa. **22** Magaalada Siyoonay, ciqaabtii xumaantaadu
way dhammaatay. Isagu innaba mar dambe maxaabiis
ahaan kuu kaxaysan maayo. Reer Edomow, xumaantaada
wuu soo ciqaabi doonaa, Oo dembiyadaadana daahuu ka
qaadi doonaa.

**5** Rabbiyow, bal xusuuso wixii nagu soo degay. Ka fiirso
oo bal eeg caydii nalagu caayay. **2** Dhaxalkayagii waxaa
helay shisheeyayaal. Guryahayagiina waxaa iska qaatay
ajnabiyo. **3** Waxaannu nahay agoommo, aabbayaal ma
lihin, Oo hooyooyinkayana carmallay noqdeen **4** Biyahayagii
lacag baannu ku cabnay, Oo qoryahayagiina waa nalaga
iibiyey. **5** Kuwii na eryanayayna way na gaadheen, Waannu
daalan nahay oo nasasho ma lihin. **6** Waxaannu gacanta
u dhiibannay Masriyiinta Iyo reer Ashuur si aannu kibis
uga dheregno. **7** Aabbayaashayo waa dembaabeen, mana
joogaan, Oo annagaa xumaatooyinkoodii xambaarannay.
**8** Addoommaa noo taliya, Oo mid gacantooda naga
samatabbixiyaana ma jiro, **9** Waxaannu kibistayada ku helnaa
naftayadoo aan biimayno, Waana seefta cidlada aawadeed.
**10** Haraggayagii wuxuu u madoobaaday sidii foorno oo kale,
Waana kulaylkii abaarta daraaddiis. **11** Naagihii Siyoon
dhexdeedaa lagu kufsaday, Hablihii bikradaha ahaana
magaalooyinka dalka Yahuudah waa lagu kufsaday. **12**
Amiirradii gacmahoodaa lagu deldelay, Oo odayaashiina
lama sharfin. **13** Barbaarradii dhagaxshiidkay qaadeen, Oo
carruurtiina rarkii qoryaha bay la kufeen. **14** Odayaashii iridday
ka joogsadeen, Oo barbaarradiina muusikadoodii farahay
ka qaadeen. **15** Farxaddii qalbigayagay ka dhammaatay,
Oo cayaartayadiina baroorashay u rogmatay. **16** Taajkii
madaxayaguu ka dhacay. Annagaa iska hoognay, waayo,
waannu dembaabnay! **17** Taas darteed qalbigayagu wuu itaal
darnaaday. Oo waxyaalahaas aawadoodna indhahayagii
way arag darnaayeen. **18** Maxaa yeelay, Buur Siyoon waa
cidlowday, Oo dawacooyin baa ku dul socda. **19** Rabbiyow,
weligaaba sida boqor baad u fadhidaa, Oo carshigaaguna
ab ka ab buu waaraa. **20** Haddaba bal maxaad weligaaba
noo illowdaa, Oo maxaad wakhti dheer noo dayrisaa? **21**
Rabbiyow, xaggaaga noo soo celi, oo waannu soo noqon
doonnaa. Maalmahayagana sida kuwii hore oo kale nooga
dhig. **22** Laakiinse dhammaantayoba waad na diidday. Oo
aad baad noogu cadhootay.

# Yexesqeel

1 Haddaba sannaddii soddonaad, bisheedii afraad,
maalinteedii shanaad, anigoo maxaabiistii Webi Kebaar
ag joogtay ku dhex jira ayaa samooyinkii furmeen, oo
waxaan arkay wax layga tusay xagga Ilaah. 2 Boqor
Yehooyaakiin maxaabiis ahaantiisii sannaddeedii shanaad
bisha maalinteedii shanaad 3 ayaa eraygii Rabbigu dalkii reer
Kaldayiin ugu yimid wadaadkii Yexesqeel ina Buusii, isagoo
Webi Kebaar ag jooga, oo halkaasay gacantii Rabbigu isagii
ku kor saarnayd. 4 Oo intaan wax fiirinayay waxaa ii muuqday
dabayl duufaan ah oo xagga woqooyi ka timid, iyo daruur
weyn, iyo dab iyada ku dhex jira, iyo iftiin hareereheeda ka
widhwidhaya, oo dhexdeedana waxaa ku jiray wax la moodo
sidii dhuxul cadaatay oo dab ka dhex dhalaalaysa. 5 Oo
waxaa dhexdeedii ka soo baxay wax u eg afar xayawaan.
Oo muuqashadooduna sidanay ahayd: waxay lahaayeen nin
ekaantiis. 6 Oo midkood kastaaba wuxuu lahaa afar weji, oo
midkood kastaaba wuxuu lahaa afar baal. 7 Oo cagahooduna
waxay ahaayeen cago toosan, oo baabacada cagahooduna
waxay u ekayd weyl baabaceeda, oo waxay u dhalaalayeen
sidii naxaas la safeeyey. 8 Oo baalashooda hoostoodana
waxay ku lahaayeen nin gacmihiis oo kale oo afarta dhinacba
uga yaal, oo afartooduba saasay u lahaayeen wejiyadooda
iyo baalashoodaba. 9 Oo baalashooduna midba midka kaluu
ku dhegganaa, oo markay socdeenna ma ay leexleexan ee
midkood kastaaba hortiisuu qummaati ugu dhaqaaqay. 10 Oo
xagga ekaanta wejiyadooduna waxay wada lahaayeen nin
wejigiis, oo afartooduba dhanka midig waxay ku lahaayeen
weji libaax, oo afartooduba waxay dhanka bidix ku lahaayeen
weji dibi; oo weliba afartoodu waxay lahaayeen weji gorgor.
11 Wejiyadoodu saasay ahaayeen, oo baalashooduna kor
bay u kala fidsanaayeen, oo midkood kastaaba laba baal
ayuu midka kan kale kula dhegganaa, oo labana waxay
ku daboolnaayeen jidhkooda. 12 Oo midkood kastaaba
hortiisuu qummaati ugu dhaqaaqay, oo waxay tageen
meel alla meeshuu ruuxu tegayoba, oo markay socdeenna
ma ay leexleexan. 13 Oo xagga ekaanta xayawaanka
waxay u ekaayeen dab qaxmaya dhuxulihiis iyo qoryo
ololaya. Oo xayawaanka dhexdooduu hor iyo dib iska daba
noqnoqonayay, oo dabkuna wuu dhalaal dheeraa, oo waxaa
dabka ka soo baxayay hillaac. 14 Oo xayawaankuna sidii
hillaaca biriqdiisa oo kale ayay u ordeen oo u soo noqdeen.
15 Haddaba intii aan xayawaanka fiirinayay waxaan arkay
giraangir dhulka korkiisa iyo xayawaanka dhinacooda taal,
oo mid kastaaba wuxuu u yiil afarta weji. 16 Oo giraangiraha
waxay u ekaayeen midabka berullos oo kale, oo afartoodiiba
way isu ekaayeen, oo muuqashadoodii iyo farsamadii loo
sameeyeyna waxaa la mooday sidii giraangir giraangir kale
ku dhex jirta. 17 Oo markay tageenna waxay ku socdeen
afartooda dhinac, oo mana ay leexleexan markay socdeen.
18 Oo wareegyadooduna aad bay u dheeraayeen, waxayna
ahaayeen wax aad iyo aad looga cabsado, oo afartoodaba
wareegyadooda waxaa ka buuxay indho miidhan. 19 Oo
markay xayawaanku socdeenba giraangiruhuna way dhinac
socdeen, oo xayawaankii markii dhulka kor looga qaadayba
giraangirihiina kor baa loo qaaday. 20 Oo meel alla meeshii
ruuxu tegeyba iyaguna way tageen, oo giraangirihiina iyagay
la sara keceen, waayo, ruuxii xayawaanku wuxuu ku jiray
giraangirihii. 21 Markii kuwaasu tageen, kuwanuna way
tageen, oo markii kuwaasu istaageenna, kuwanuna way
istaageen, oo markii kuwaas dhulka kor looga qaadayna
giraangirihiina dhinacoodaa kor loola qaaday, waayo, ruuxii
xayawaanku wuxuu ku jiray giraangirihii. 22 Xayawaanka
madaxoodana waxaa ka korreeyey cir ekaantiisa la moodo
baraf aad looga cabsado oo ku dul fidsan. 23 Oo cirka
hoostiisa ayaa baalashoodu ku toosnaayeen, oo midba kan
kale xaggiisuu u sii jeeday. Oo midkood kastaaba wuxuu
lahaa laba baal oo dhinacan uga daboolan iyo laba baal oo
jidhkiisa dhinacaas ugu daboolan. 24 Oo markay socdeenba
waxaan maqlay sanqadhii baalashooda oo la moodo sida
biyo badan guuxood, iyo sida Ilaaha Qaadirka ah codkiisii,
iyo buuq sanqadhiis la moodo sidii ciidan hugunkiis oo kale.
Oo markay istaageenna baalashoodii bay dejiyeen. 25 Oo
cod baa ka yeedhay cirkii madaxooda ka korreeyey, oo
markay istaageen baalashooda bay dejiyeen. 26 Oo cirkii
madaxooda ka korreeyey dushiisana waxaa ka muuqday
wax carshi u eg oo ekaantiisa la moodo sidii dhagax safayr
ah, oo waxaa wixii carshiga la moodo dushiisa ka muuqday
wax nin u eg. 27 Oo qaarkiisa hore wuxuu iila ekaa dhuxul
cadaatay oo uu dab ku jiro oo hareerihiisa ku wareegsan,
oo qaarkiisa dambena wuxuu iila ekaa sidii dab oo kale,
oo hareerihiisana waxaa ku wareegsanaa iftiin dhalaalaya.
28 Oo ekaantii iftiinku ku wareegsanaana waxay u ekayd
qaansoroobaad maalin roobeed daruurta ku taal. Taasu
waxay ahayd ekaantii ammaanta Rabbiga. Oo markaan
arkay ayaan wejiga u dhacay, oo waxaan maqlay mid
hadlaya codkiis.

2 Oo isna wuxuu igu yidhi, Wiilka Aadamow, bal istaag,
waan kula hadlayaaye. 2 Oo markuu ila hadlay ayaa
ruuxii i soo galay, oo cagahayguu igu taagay, waanan
maqlay kii ila hadlay. 3 Oo isaguna wuxuu igu yidhi, Wiilka
Aadamow, waxaan kuu dirayaa reer binu Israa'iil oo ah

dad caasiyiin ah oo iga caasiyoobay. Ilaa maantadan iyaga
iyo awowayaashoodba way igu xadgudbayeen. 4 Iyagu
waa dad weji adag oo qalbi qallafsan. Iyagaan kuu dirayaa,
waxaanad ku tidhaahdaa, Sayidka Rabbiga ahu wax buu
idinku leeyahay. 5 Oo iyagu hadday maqlaan iyo hadday
diidaanba, weli way ogaan doonaan in nebi iyaga dhex
joogay (waayo, iyagu waxa weeye reer caasiyoobay). 6
Wiilka Aadamow, iyaga ha ka baqin, erayadoodana ha ka
baqin, in kastoo yamaarug iyo qodxan ay kugu wareegsan
yihiin oo aad hangarallayaal dhex deggan tahay, erayadooda
ha ka cabsan oo aragtidooda ha ka baqin, waayo, iyagu waa
reer caasiyoobay. 7 Oo adigu waa inaad erayadayda iyaga u
sheegtaa, hadday maqlaan iyo hadday diidaanba, waayo,
iyagu waa kuwa aad iyo aad u caasiyoobay. 8 Laakiinse
adigu, Wiilka Aadamow, waxaan kugu idhaahdo maqal, oo
caasi ha noqon sida reerkaas caasiyoobay oo kale. Afkaaga
kala qaad oo waxaan ku siiyo cun. 9 Oo intaan wax fiirinayay
waxaan arkay gacan la ii soo diray, oo bal eeg, waxaa ku
jiray qorniin duudduuban. 10 Oo isna hortayduu ku kala
bixiyey, oo dusha iyo hoostaba wax baa kaga qornaa, oo
waxaa ku qornaa baroorasho iyo oohin iyo hoog.

**3** Oo wuxuu igu yidhi, Wiilka Aadamow, waxaad heshid
cun. Qorniinkan duudduuban cun, oo tag, oo waxaad la
hadashaa reer binu Israa'iil. 2 Sidaas daraaddeed afkaan kala
qaaday oo isna qorniinkii duudduubnaa wuu i cunsiiyey. 3 Oo
wuxuu igu yidhi, Wiilka Aadamow, calooshaada geli oo ka
buuxi qorniinkan duudduuban oo aan ku siiyo. Markaasaan
cunay, oo wuxuu afkayga ugu dhadhan macaanaa sidii
malab oo kale. 4 Markaasuu igu yidhi, Wiilka Aadamow, reer
binu Israa'iil u tag, oo erayadayda kula hadal. 5 Waayo,
laguuma dirin dad hadal qalaad oo afkoodu adag yahay,
laakiinse waxaa laguu diray reer binu Israa'iil. 6 Laguumana
dirin dadyow badan oo hadal qalaad oo afkoodu adag yahay,
oo adaan erayadooda garan karin. Hubaal haddaan iyaga
kuu diri lahaa, way maqli lahaayeen. 7 Laakiinse reer binu
Israa'iil dooni maayaan inay ku maqlaan, maxaa yeelay,
dooni maayaan inay aniga i maqlaan, waayo, reer binu
Israa'iil oo dhammu waa dad weji adag oo qalbi qallafsan. 8
Bal eeg, wejigaaga waan ka sii adkeeyey wejigooda, oo
foolkaagana waan ka sii adkeeyey foolkooda. 9 Oo foolkaaga
waxaan ka dhigay sidii dheemman dhagax ka sii adag oo
kale. Ha ka cabsan iyaga, oo aragtidoodana ha ka baqin in
kastoo ay reer caasiyoobay yihiin. 10 Oo weliba wuxuu igu
yidhi, Wiilka Aadamow, erayadayda aan kugula hadli doono
oo dhan qalbigaaga ku qaado oo dhegahaaga ku maqal.
11 Haddaba waxaad u tagtaa kuwa maxaabiista ah, oo
dadkaaga ah, oo intaad la hadashid waxaad ku tidhaahdaa,
Sayidka Rabbiga ahu wax buu idinku leeyahay, hadday
maqlaan iyo hadday diidaanba. 12 Markaasaa ruuxu kor ii
qaaday, oo waxaan gadaashayda ka maqlay cod guuxaya oo
leh, Rabbiga ammaantiisu meesheeda barakay ku leedahay,
13 waxayna ahayd sanqadhii baalashii xayawaankii markay
istaabtaabanayeen, iyo sanqadhii giraangirihii iyaga dhinac
socday, oo sanqadh yaacideed ahayd. 14 Sidaasuu ruuxii kor
iigu qaaday oo meel fog ii waday, oo anna waxaan ku tegey
dhirif qadhaadh iyo naftaydoo kulul, oo gacantii Rabbigaa igu
kor xoog badnayd. 15 Markaasaan Teel Aabiib maxaabiistii
Webi Kebaar ag degganaa, iyo ilaa meeshii ay fadhiyeen ugu
tegey, oo halkaasaan iyagii toddoba maalmood dhex joogay
anigoo naxdin la fadhiya. 16 Oo markay toddoba maalmood
dhammaadeen waxaa ii yimid Eraygii Rabbiga isagoo leh,
17 Wiilka Aadamow, waardiye baan reer binu Israa'iil kaaga
dhigay, haddaba bal erayga afkayga ka soo baxaya maqal,
oo digniin xaggayga ka timid iyaga gaadhsii. 18 Markaan
sharrowga ku idhaahdo, Hubaal waad dhiman doontaa,
haddaadan isaga u digin, oo aadan sharrowga la hadlin si
aad jidkiisa sharka ah uga digto inaad naftiisa badbaadiso
aawadeed, ninkaas sharrowga ahu xumaantiisuu ku dhex
dhiman doonaa, laakiinse dhiiggiisa gacantaadaan weyddiin
doonaa. 19 Laakiinse haddaad sharrowga u digto, oo uusan
isagu sharnimadiisa amase jidkiisa sharka ah ka soo noqon,
markaas xumaantiisuu ku dhiman doonaa, adiguse naftaadii
waad samatabbixisay. 20 Oo haddana haddii nin xaq ahu
uu xaqnimadiisii ka noqdo oo uu xumaan sameeyo, intaan
dhagax turunturo hor dhigo, isagu wuu dhiman doonaa.
Uma aadan digin, oo saas darteed dembigiisuu ku dhiman
doonaa, oo falimihiisii xaqa ahaa ee uu samayn jirayna lama
soo xusuusan doono, laakiinse dhiiggiisa gacantaadaan
weyddiin doonaa. 21 Habase ahaatee haddaad ninka xaqa
ah u digtid, si uusan ka xaqa ahu u dembaabin oo uusan
dembi u samayn, markaas hubaal wuu noolaan doonaa,
maxaa yeelay, wuu digniin qaatay, adiguna naftaadii waad
samatabbixisay. 22 Oo gacantii Rabbiguna halkaasay igu
kor saarnayd, oo wuxuu igu yidhi, Kac oo bannaanka u
bax halkaasaan kugula hadli doonaaye. 23 Markaasaan
kacay oo bannaankii u baxay, oo bal eeg, waxaa halkaas
jirtay ammaantii Rabbiga, taasoo u eg ammaantii aan Webi
Kebaar agtiisa ku arkay, oo aniguna wejigaan u dhacay.
24 Markaasaa ruuxii i soo galay, oo cagaha igu taagay,
wuuna ila hadlay isagoo leh, Tag oo gurigaaga isku xidh.
25 Laakiinse Wiilka Aadamow, bal ogow, xadhkaa lagugu
xidhi doonaa oo adna waad ku xidhnaan doontaa, oo dadka
dhexdiisana uma aad bixi doontid. 26 Oo carrabkaaga

dhabxanaggaagaan ku dhejin doonaa, si aad carrablaawe u
noqotid, oo aanad iyaga mid canaanta ugu noqon, waayo,
iyagu waa reer caasiyoobay. **27** Laakiinse markaan kula
hadlo, afkaagaan furi doonaa oo waxaad ku odhan doontaa,
Sayidka Rabbiga ahu sidaasuu leeyahay. Kii wax maqlaa,
ha maqlo, oo kii diidaana ha diido, waayo, iyagu waa reer
caasiyoobay.

**4** Wiilka Aadamow, xabbad leben ah soo qaad oo hortaada
dhig, oo waxaad ku dul taswiirtaa magaalo, taasoo ah
Yeruusaalem, **2** oo iyada weerar, qalcadona ku hareeree,
oo tuulmona ku tuul, oo xerooyinna hareereheeda ka dhis,
oo wax lagu dumiyona ku wareeji. **3** Oo weliba birdaawe
soo qaad, oo waxaad ka dhigtaa derbi bir ah oo adiga
iyo magaalada u dhexeeya, oo wejigaagana waxaad u
sii jeedisaa xaggeeda, oo iyana waa la weerari doonaa,
oo adiguna waa inaad iyada weerar u dhigtaa. Oo taasu
calaamad bay u noqon doontaa reer binu Israa'iil. **4** Oo
weliba dhinacaaga bidix u jiifso, oo waxaad kor saartaa
xumaantii dadka dalka Israa'iil. Maalmaha aad ku jiifto inta
tiradoodu tahay oo kale ayaad xumaantooda sidi doontaa. **5**
Waayo, waxaan ku dul saaray sannadihii xumaantooda, inta
maalmaha tiradoodu tahay saddex boqol iyo sagaashan
maalmood, oo sidaasaad xumaanta dadka dalka Israa'iil u
sidi doontaa. **6** Oo markaad intaas dhammaysid, haddana
waxaad u jiifsataa dhinacaaga midig, oo waxaad afartan
maalmood sidi doontaa xumaantii dadka dalka Yahuudah,
maalin kastaba sannad baan kaaga dhigay. **7** Oo waxaad
wejigaaga u jeedisaa weerarka Yeruusaalem xaggiisa, iyadoo
gacantaadu qaawan tahay, oo waa inaad iyada wax ka sii
sheegtaa. **8** Oo bal ogow, anigu xadhkaan kugu xidhxidhi
doonaa, oo waa inaadan hadba dhinac isu rogin ilaa aad
dhammaysid maalmihii weerarkaaga. **9** Oo weliba waxaad
soo qaadataa sarreen, iyo shaciir, iyo digir, iyo misir, iyo
hadhuudh, iyo heed, oo kulligood isku weel ku shub, oo
kibis ka samayso, oo maalmaha aad dhinaca u jiifto intay
tiradoodu tahay in le'eg, oo ah saddex boqol iyo sagaashan
maalmood, waa inaad cuntaa. **10** Oo cuntada aad cuni
doontaana waa inay ahaataa mid la miisaamay, oo maalintii
labaatan sheqel ayaa kuu go'an, oo waa inaad goor ka goor
cuntaa. **11** Oo biyahana waa inaad qiyaas u cabtaa, oo
waxaa kuu go'an hiin lix meelood loo dhigay meeshiis, oo
waa inaad goor ka goor cabtaa. **12** Oo cuntadaadana waxaad
u cuntaa sida kibis shaciireed oo kale, oo waxaad ku dubataa
saxaro dad iyadoo ay indhaha ku hayaan. **13** Oo Rabbigu
wuxuu yidhi, Sidaas oo kale ayaa reer binu Israa'iil kibistooda
nijaasowday ugu dhex cuni doonaan quruumihii aan iyaga u
kaxayn doonoba. **14** Markaasaan idhi, Sayidow, Rabbiyow,
bal eeg, naftaydu weligeed ma ay nijaasoobin, waayo, tan
iyo yaraantaydii iyo ilaa haddatan marnaba ma aan cunin
wax bakhtiyey ama wax bahal bakhtiistay toona, oo hilib
karaahiyo ahuna innaba afkayga ma gelin. **15** Markaasuu
igu yidhi, Bal eeg, saxaro dad waxaan kuugu beddelay saalo
lo', oo waa inaad cuntadaada ku diyaarsataa. **16** Oo weliba
wuxuu kaloo igu yidhi, Wiilka Aadamow, bal ogow, usha
kibista ayaan Yeruusaalem ku dhex jebin doonaa, oo iyagu
waxay kibista ku cuni doonaan miisaan iyo digtoonaan,
oo biyahana waxay ku cabbi doonaan qiyaas iyo yaab,
**17** si ay baad iyo biyo u waayaan oo uu midkoodba kan
kale ula welwelo, oo ay xumaantooda aawadeed u wada
baabba'aan.

**5** Wiilka Aadamow, seef af badan soo qaado, oo sida
mandiisha rayiislaha ugu isticmaal, oo waxaad ku xiirataa
madaxa iyo gadhka, oo markaas kafado soo qaado si
aad timaha ugu miisaantid, oo kala qaybi. **2** Timaha
saddexdooda dalool dalool magaalada dhexdeeda dab
ku gub markii maalmaha weerarku ay dhammaystirmaan,
oo haddana waxaad qaadataa dalool kale, oo magaalada
hareereheeda seefta la dhac, oo daloolka saddexaadna
dabaysha ku kala firdhi, oo aniguna seef baan ka daba
qaadan doonaa. **3** Oo weliba wuxoogaa yar qaad oo
daraftaada gunud. **4** Oo haddana kuwaas qaar ka qaad
oo dab ku dhex tuur, oo dab ku gub, oo iyaga dab baa ka
soo bixi doona, wuxuuna wada gaadhi doonaa reer binu
Israa'iil oo dhan. **5** Sayidka Rabbiga ahu wuxuu leeyahay,
Tanu waa Yeruusaalem. Quruumahaan dhex dhigay, oo
hareereheedana waddammaa ku wareegsan. **6** Oo iyana
xukummadaydii bay sharnimadeedii kaga caasiyowday
in ka sii badan quruumaha kale, oo qaynuunnadaydiina
way ka caasiyowday in ka sii badan waddammada
hareereheeda ku wareegsan, waayo, iyagu xukummadaydii
iyo qaynuunnadaydiiba way diideen, oo innaba kuma ay
socon. **7** Sidaas daraaddeed Sayidka Rabbiga ahu wuxuu
leeyahay, Quruumaha hareerihiinna ku wareegsan waad ka
sii belaayo badiseen, oo qaynuunnadaydiina kuma aydaan
socon, oo xukummadaydiina ma aydaan xajin, oo quruumaha
idinku wareegsan xukummadoodana ma aydaan samayn, **8**
haddaba sidaas daraaddeed Sayidka Rabbiga ahu wuxuu
leeyahay, Bal eeg, aniga qudhaydu col baan kugu ahay, oo
iyadoo quruumuhu ay indhaha ku hayaan ayaan xukummo
dhexdaada ku samayn doonaa. **9** Oo waxaan dhexdaada
ku samayn doonaa wax aanan hore u samayn, oo hadda
ka dibna aanan samayn doonin wax la mid ah, waana
waxyaalahaagii karaahiyada ahaa oo dhan daraaddood. **10**

Sidaas daraaddeed aabbayaashu dhexdaaday wiilashooda
ku cuni doonaan, oo wiilashuna aabbayaashood bay cuni
doonaan, oo dhexdaadaan xukummo ku samayn doonaa,
oo kuwaaga hadhay oo dhanna waxaan u kala firdhin
doonaa dabaylaha oo dhan. **11** Sidaas daraaddeed Sayidka
Rabbiga ahu wuxuu leeyahay, Noloshaydaan ku dhaartaye,
sida xaqiiqada ah, anigu waan ku dhimi doonaa, oo
ishayduna kuuma ay tudhi doonto, oo innaba kuuma aan
nixi doono, maxaa yeelay, waxaad meeshaydii quduuska ah
ku nijaasaysay waxyaalahaagii la nacay oo karaahiyada
ahaa oo dhan. **12** Saddexdaada dalool baa belaayo u le'an
doona, oo abaar bay dhexdaada ugu baabbi'i doonaan,
oo daloolna seef buu hareerahaaga ugu le'an doonaa, oo
daloolka saddexaadna dabaylaha oo dhan baan ku kala
firdhin doonaa, oo seef baan ka daba qaadan doonaa.
**13** Oo sidaasaa xanaaqaygu ku dhammaystirmi doonaa,
cadhadaydana iyagaan ku dejin doonaa, markaasaan
qaboobi doonaa, oo waxay ogaan doonaan inaan aniga
Rabbiga ahu qiiradayda kula hadlay markaan cadhadaydii
korkooda ku dhammaystiray. **14** Oo weliba waxaan kaa
dhigi doonaa meel cidla ah iyo cay dhex taal quruumaha
hareerahaaga ku wareegsan, iyadoo ay kuwa ku soo ag
mara oo dhanba indhaha ku hayaan. **15** Sidaasay quruumaha
hareerahaaga ku wareegsan ugu noqon doontaa cay, iyo
ceeb, iyo wax lagu waana qaato, iyo wax lagu yaabo,
markaan dhexdaada xukummo ugu sameeyo xanaaq iyo
cadho iyo canaan kulul. Aniga Rabbiga ah ayaa sidaas ku
hadlay. **16** Saasaa noqon doonta markaan dushooda ku
soo dayn doono fallaadhaha baas ee abaarta ah, oo inay
wax baabbi'iyaan u qaybsan, oo aan u soo diri doono inay
idin baabbi'iyaan, oo abaartaan idiin sii badin doonaa, oo
ushiinna kibistana waan kala jebin doonaa, **17** oo waxaan
kugu soo dayn doonaa abaar iyo dugaag xunxun, oo iyana
way ku gablamin doonaan, oo belaayo iyo dhiig ayaa ku
dhex mari doona, oo seef baan kugu soo dayn doonaa.
Aniga Rabbiga ah ayaa sidaas ku hadlay.

**6** Oo haddana Eraygii Rabbiga ayaa ii yimid, isagoo
leh, **2** Wiilka Aadamow, wejigaaga buuraha dalka reer
binu Israa'iil u jeedi oo iyaga wax ka sii sheeg. **3** Oo
waxaad tidhaahdaa, Buuraha reer binu Israa'iilow, bal
Sayidka Rabbiga ah eraygiisa maqla. Sayidka Rabbiga ahu
wuxuu ku leeyahay buuraha, iyo kuraha, iyo webiyada,
iyo dooxooyinkaba, Bal ogaada, aniga qudhaydu seef
baan idinku soo dayn doonaa, oo waxaan wada baabbi'in
doonaa meelihiinna sarsare. **4** Meelihiinna allabariguna cidla
bay wada noqon doonaan, oo sanamyadiinna qorraxdana
waa la wada burburin doonaa, oo raggiinna la laayayna
sanamyadiinna waan ku soo hor tuuri doonaa. **5** Oo
meydadka reer binu Israa'iil waxaan hor dhigi doonaa
sanamyadooda, oo lafihiinnana waxaan ku kala firdhin
doonaa meelihiinna allabariga hareerahooda. **6** Oo meel
alla meeshaad deggan tihiinba magaalooyinka waa laga
dumin doonaa, oo meelaha sarsarena cidla bay wada noqon
doonaan, si ay meelihiinna allabarigu u burburaan oo ay
cidla u noqdaan, oo ay sanamyadiinnuna jajabaan oo ay u
wada dhammaadaan, oo sanamyadiinna qorraxdana loo
wada jaro, oo shuqulladiinnana loo wada tirtiro. **7** Oo kuwa la
laayayna dhexdiinnay ku soo daadan doonaan, oo waxaad
ogaan doontaan inaan anigu Rabbiga ahay. **8** Laakiinse qaar
baan reebi doonaa, si aad wuxoogaa seefta kaga baxsaday
quruumaha dhexdooda u lahaataan, markaad waddammada
ku kala dhex firdhi doontaan. **9** Oo kuwii idinka baxsadaa
waxay igu xusuusan doonaan quruumaha dhexdooda
halkaasoo loo kaxaysan doono iyagoo maxaabiis ah, waayo,
anigu waxaan ku calool xumaaday qalbigoodii dhilloobay oo
iga tegey, iyo indhahoodii sanamyadooda dhillanimada la
daba galay, oo iyaga qudhoodu waxay isku nici doonaan
xumaatooyinkii ay ku dhex sameeyeen waxyaalahoodii
karaahiyada ahaa oo dhan. **10** Oo waxay ogaan doonaan
inaan anigu Rabbiga ahay iyo inaanan waxtarla'aan u
odhan, Belaayadaas ayaan iyaga ku samayn doonaa. **11**
Sayidka Rabbiga ahu wuxuu leeyahay, Sacabbada isku
dhufo oo cagta dhulka ku dhufo, oo Hoogay! u dheh
waxyaalihii karaahiyada ahaa oo dhan ee ay reer binu Israa'iil
sameeyeen aawadood, waayo, waxay ku baabbi'i doonaan
seef, iyo abaar, iyo belaayo. **12** Kii meel fog joogaa belaayo
buu u dhiman doonaa, oo kii meel dhow joogaana seef buu
ku dhiman doonaa, oo kii magaalada la weeraraya weli
ku hadhaana abaar buu ku dhiman doonaa, oo sidaasaan
cadhadayda ugu dhammaystiri doonaa. **13** Oo markaasaad
ogaan doontaan inaan anigu Rabbiga ahay, markii raggooda
la laayay ay ku ag daadsanaadaan sanamyadooda ku
hareeraysan meelahooda allabariga, oo kor saaran kur
kasta oo dheer, iyo buuraha dhaladooda oo dhan, iyo geed
kasta oo cagaar ah hoostiisa, iyo geed kasta oo alloon
la yidhaahdo oo weyn, kuwaasoo ah meelaha ay carafta
udgoon ugu bixiyeen sanamyadooda oo dhan. **14** Anigu
gacantayda ayaan iyaga ku fidin doonaa, oo dalkana meel
cidla ah ayaan ka dhigi doonaa, oo waxaan ka dhigi doonaa
meel ka sii daran cidlada ku taal xagga Dibla meelaha ay
deggan yihiin oo dhan, oo markaasay ogaan doonaan inaan
anigu Rabbiga ahay.

7 Oo haddana Eraygii Rabbiga ayaa ii yimid isagoo leh,
2 Wiilka Aadamow, Sayidka Rabbiga ahu wuxuu dalka
reer binu Israa'iil ku leeyahay, Waa kaa dhammaadkii, dalka
afartiisa geesood dhammaadkii baa gaadhay. 3 Dhammaadkii
haddeer buu kugu soo degay, oo cadhadaydaan kugu ridi
doonaa, oo siday jidadkaagu ahaayeen ayaan kuu xukumi
doonaa, oo waxaan kaa abaalmarin doonaa waxyaalihii
karaahiyada ahaa oo dhan. 4 Oo indhahaygu kuuma
tudhi doonaan, oo innaba kuuma aan nixi doono, laakiinse
siday jidadkaagu ahaayeen ayaan kaa abaalmarin doonaa,
oo waxyaalahaaga karaahiyada ahuna way ku dhex oolli
doonaan, oo idinkuna waad ogaan doontaan inaan anigu
Rabbiga ahay. 5 Sayidka Rabbiga ahu wuxuu leeyahay,
Belaayo! Belaayo gooni ah! Bal fiiriya, way soo socotaaye! 6
Dhammaad baa yimid, dhammaadkii waa yimid, bal eeg,
wuu kugu soo toosayaa, oo haddana waa soo socdaaye!
7 Kan dalka dhex degganow, masiibadaadii waa kuu
timid! Wakhtigii waa yimid, oo maalintuna way soo dhow
dahay, taasoo ah maalin dhibeed oo aan ahayn dhawaaqa
faraxa badan ee buuraha korkooda. 8 Goor dhow baan
cadhadayda kugu kor shubi doonaa, oo xanaaqaygaan kugu
kor dhammaystiri doonaa, oo siday jidadkaagu ahaayeen
ayaan kuu xukumi doonaa, oo waxaan kaa abaalmarin
doonaa waxyaalahaagii karaahiyada ahaa oo dhan. 9 Oo
indhahaygu kuuma tudhi doonaan, oo innaba kuuma aan nixi
doono, oo waxaan kaa abaalmarin doonaa siday jidadkaagu
ahaayeen, oo waxyaalahaaga karaahiyada ahuna way ku
dhex oolli doonaan, oo idinkuna waad ogaan doontaan inaan
anigoo Rabbiga ahu wax idinku dhufto. 10 Bal maalinta
eega, bal eega way imanaysaa, masiibadaadii waa soo
baxday, ushii way magooshay, oo kibir waa ubxiyey. 11
Dulmigii wuxuu u kacay sidii ul shareed. Midkoodna ma
hadhi doono badnaantooda iyo maalkooda badan toona,
oo looma barooran doono. 12 Wakhtigii waa yimid, oo
maalintii way soo dhow dahay. Kan wax iibsadaa yuusan
waxba rayrayn, kan wax iibiyaana yuusan waxba murugoon,
waayo, dadkooda badan oo dhanba cadhaa dul saaran.
13 Waayo, kan wax iibiyey uma uu soo noqon doono
wixii uu iibiyey in kastoo uu weli kuwa noolnool ku dhex
jiro, waayo, waxyaalihii la tusay waxay ku saabsan yihiin
dadkooda badan oo dhan, oo midkoodna innaba sooma
noqon doono, xumaanta noloshiisana kuma xoogaysan
doono. 14 Turumbadii bay ku dhufteen, oo wax kastaba way
sii diyaariyeen, laakiinse midna dagaalka uma baxo, waayo,
dadkooda badan cadhadaydii baa dul saaran. 15 Seeftii
dibadday joogtaa, oo belaayadii iyo abaartiina gudahay ku
jiraan. Kii berrinka joogaa seef buu ku dhiman doonaa, oo
kii magaalada joogaana abaar iyo belaayo ayaa baabbi'in
doona. 16 Laakiinse kuwoodii baxsadaa way cayman
doonaan, oo waxay joogi doonaan buuraha dushooda sida
qoolleyda dooxooyinka iyagoo kulligood barooranaya oo mid
kastaaba xumaantiisii aawadeed u ooyaya. 17 Gacmaha oo
dhammu way taag gabi doonaan, oo jilbaha oo dhammuna
sida biyo oo kale ayay u tabaryaraan doonaan. 18 Oo
weliba iyagu waxay guntan doonaan dhar joonyad ah,
oo naxdin baa liqi doonta, oo wejiyada oo dhammuna
way ceeboobi doonaan, oo madaxyada oo dhammuna
way xiirnaan doonaan. 19 Lacagtooda jidadkay ku xoori
doonaan, oo dahabkooduna wuxuu noqon doonaa sida
wasakh oo kale. Maalinta cadhada Rabbiga lacagtooda iyo
dahabkooduba ma ay samatabbixin kari doonaan. Naftooda
ma ay dhergin doonaan, oo calooshoodana kama ay buuxin
doonaan, maxaa yeelay, kuwaasu waxay ahaayeen dhagaxii
turunturada ee xumaantooda. 20 Quruxdii sharraxaaddiisa
kibir bay u beddeleen, oo waxay ka sameeyeen sanamyada
waxyaalahoodii karaahiyada ahaa oo la nacay, sidaas
daraaddeed waxaan iyaga uga dhigay sida wasakh oo
kale. 21 Oo booli ahaan ayaan shisheeyayaal gacanta
ugu gelin doonaa oo sida wax la soo dhacay oo kalena
ayaan sharrowyada dunida u siin doonaa, oo iyaguna way
nijaasayn doonaan. 22 Oo weliba wejigaygana iyagaan ka sii
jeedin doonaa, oo iyana meeshayda qarsoon bay nijaasayn
doonaan, oo kuwa wax dhaca ayaa gudaheeda geli doona
oo nijaasayn doona. 23 Silsilad samee, waayo, dalka waxaa
ka buuxda gacankudhiiglenimo, oo magaaladana waxaa
ka buuxa dulmi. 24 Sidaas daraaddeed waxaan u keeni
doonaa kuwa ugu liita ee quruumaha, oo iyana guryahooda
way hantiyi doonaan, oo weliba waxaan joojin doonaa kuwa
xoogga badan kibirkooda, oo meelahooda quduuska ahna
waa la wada nijaasayn doonaa. 25 Halligaad baa imanaysa,
oo iyagu nabad bay doondooni doonaan, laakiinse innaba
ma ay jiri doonto. 26 Belaayaba belaayay ku soo kor degi
doontaa, war belef ahuna war belef ah buu ka kor iman
doonaa, oo markaasay wax nebi la tuso doondooni doonaan,
laakiinse sharcigu wadaaddada wuu ka baabbi'i doonaa,
oo taladuna odayaasha way ka dhammaan doontaa. 27
Boqorku wuu barooran doonaa, oo amiirkuna cabsi buu
huwan doonaa, oo dadka dalka deggan gacmahooduna way
gariiri doonaan, oo anigu siday jidadkoodu ahaayeen ayaan
ku samayn doonaa, oo siday galabsadaanna waan u xukumi
doonaa, oo waxay ogaan doonaan inaan anigu Rabbiga
ahay.

8 Oo sannaddii lixaad, bisheedii lixaad, maalinteedii
shanaad intii aan gurigaygii dhex fadhiyeyey, oo ay
odayaashii dalka Yahuudah i hor fadhiyeyeen ayaa gacantii
Sayidka Rabbiga ahu igu soo kor degtay. 2 Markaasaa
intaan wax fiirinayay waxaa ii muuqday wax muuqashadiisu
u ekayd dab oo kale, oo qaarkiisa dambe wuxuu u ekaa
dab, oo qaarkiisa horena wuxuu u ekaa dhuxul cadaatay oo
dhalaalaysa. 3 Oo isna wax gacan u eg buu igu soo taagay,
oo wuxuu igu dhegay timahayga, oo ruuxii ayaa dhulka iyo
samada dhexdooda kor iigu qaaday, oo waxyaalihii Ilaah i
tusay wuxuu iigu keenay Yeruusaalem, iyo iridda gudaha ku
taal albaabkeeda xagga woqooyi u sii jeeda, oo halkaas
waxaa yiil kursigii sanamkii hinaasada, kaasoo hinaasada
kiciya. 4 Oo bal eeg, ammaantii Ilaaha reer binu Israa'iil
ayaa halkaas joogtay, oo waxay u ekayd sidii muuqashadii
aan bannaanka ku arkay oo kale. 5 Oo markaasuu igu
yidhi, Wiilka Aadamow, bal haatan indhaha xagga woqooyi
ku taag. Markaasaan indhaha kor ugu taagay jidkii xagga
woqooyi, oo waxaan xaggii woqooyi iriddii meeshii allabariga
ku arkay sanamkan hinaasada ee iridda ka taagan. 6 Oo
wuxuu kaloo igu sii yidhi, Wiilka Aadamow, ma u jeedda
waxa ay samaynayaan, xataa waxyaalaha waaweyn oo
karaahiyada ah ee ay reer binu Israa'iil halkan ku sameeyaan
si aan meeshayda quduuska ah uga sii fogaado? Laakiinse
bal haddana waxaad arki doontaa waxyaalo karaahiyo ah oo
tan ka sii weyn. 7 Oo haddana wuxuu i geeyey albaabkii
barxadda, oo markaan wax fiiriyey waxaan arkay god derbiga
ku dhex yaal. 8 Markaasuu igu yidhi, Wiilka Aadamow, bal
haddana derbiga qod, oo markaan derbigii qoday waxaan
arkay albaab. 9 Oo isna wuxuu igu yidhi, Sii gal, oo bal
fiiri waxyaalaha karaahiyada iyo sharka ah oo ay halkan
ku samaynayaan. 10 Sidaas daraaddeed waan galay oo
waxaan arkay cayn kasta oo wax gurguurta ah, iyo xayawaan
karaahiyo ah, iyo sanamyadii reer binu Israa'iil oo dhan oo
lagu taswiiray derbiga hareerihiisa oo dhan. 11 Oo waxaa
iyagii halkaas ku hor taagnaa toddobaatan nin oo odayaashii
reer binu Israa'iil ka mid ahaa, oo waxaa dhexdooda taagnaa
Ya'asanyaah ina Shaafaan, oo ninkood kastaaba wuxuu
gacanta ku haystay idankiisii, oo waxaa kor uga baxayay
caraftii qiiqii fooxa. 12 Markaasuu igu yidhi, Wiilka Aadamow,
ma aragtay waxa odayaashii reer binu Israa'iil ay gudcurka ku
sameeyaan, oo ninkood kastaaba uu qolladihiisa taswiirta ku
sameeyo? Waayo, waxay isyidhaahdaan, Rabbigu inooma
jeedo, waayo, Rabbigu dhulkuu ka tegey. 13 Oo weliba wuxuu
igu sii yidhi, Bal haddana waxaad arki doontaa waxyaalo
kale oo karaahiyo ah oo kuwan ka sii weyn. 14 Markaasuu i
geeyey albaabkii iriddii gurigii Rabbiga oo xagga woqooyi u
sii jeeday, oo waxaan halkaas ku arkay naagaha fadhiya
oo sanamkii Tammuus u ooyaya. 15 Markaasuu igu yidhi,
Waxaas ma aragtay, Wiilka Aadamow? Bal haddana waxaad
arki doontaa waxyaalo kale oo karaahiyo ah oo kuwan ka sii
weyn. 16 Oo haddana wuxuu i geeyey barxaddii hoose oo
gurigii Rabbiga, oo bal eeg, iriddii macbudkii Rabbiga, meel
u dhaxaysa balbalada iyo meeshii allabariga waxaa taagnaa
rag shan iyo labaatan ku dhow iyagoo dhabarka macbudkii
Rabbiga u sii jeediyey, wejigana xagga bari u sii jeediyey, oo
waxay caabudayeen qorraxda bari jirta. 17 Markaasuu igu
yidhi, Waxan ma aragtay, Wiilka Aadamow? Tanu ma wax
dadka Yahuudah u fudud baa inay sameeyaan waxyaalaha
karaahiyada ah ee ay halkan ku samaynayaan? Waayo,
dalkii dulmi bay ka buuxiyeen oo mar kalay u noqdeen
inay iga cadhaysiiyaan, oo bal eeg, laantii ayay sanka u
dhoweeyeen. 18 Oo sidaas daraaddeed weli cadhaan ku
shaqayn doonaa, indhahaygu uma tudhi doonaan, oo innaba
uma aan nixi doono, oo in kastoo ay dhegahaygu qaylo
weyn ugu qayliyaanna innaba ma aan maqli doono.

9 Markaasuu dhegahayga cod weyn ugu qayliyey, isagoo
leh, Kuwa magaalada u taliya soo dhowee, iyadoo
ninkood kastaaba uu hubkiisa uu wax ku baabbi'iyo gacanta
ku haysto. 2 Oo bal eeg, lix nin baa waxay ka yimaadeen
iriddii sare xaggeeda taasoo xagga woqooyi u sii jeedda, oo
midkood kastaaba wuxuu gacanta ku haystay hubka uu wax
ku laayo, oo waxaa dhexdooda joogay mid dhar wanaagsan
qaba, oo dhinacana waxaa ugu xidhnaa geeskii khadka kan
wax qora. Markaasay galeen oo waxay ag istaageen meeshii
allabariga ee naxaasta ahayd. 3 Kolkaasaa ammaantii
Ilaaha reer binu Israa'iil kor bay uga kacday keruubkii ay kor
saarnayd, oo waxay tagtay guriga marinkiisii, oo wuxuu u
yeedhay ninkii dharkii wanaagsanaa qabay oo dhiniciisa ku
sitay geeskii khadka kan wax qora. 4 Markaasaa Rabbigu
isagii ku yidhi, Magaalada Yeruusaalem dhexdeeda mar,
oo waxaad calaamad ku dhigtaa jaaha dadka u taahaya
oo u qaylinaya waxyaalaha karaahiyada ah oo dhexdeeda
lagu sameeyo oo dhan. 5 Oo kuwii kalena wuxuu anigoo
maqlaya ku yidhi, Isaga dabadiis magaalada dhex mara
oo wada laaya, oo indhihiinnu yaanay u tudhin, oo innaba
ha u nixina. 6 Oo waxaad wada laysaan odayaasha,
iyo barbaarrada, iyo gabdhaha, iyo carruurta yaryar, iyo
naagahaba, laakiinse innaba ha u dhowaanina nin alla
ninkii ay calaamaddu ku taal, oo waxaad ka bilowdaan
meeshayda allabariga. Markaasay waxay ka bilaabeen
raggii odayaasha ahaa oo guriga hortiisa joogay. 7 Oo
wuxuu iyagii ku yidhi, Guriga nijaaseeya, oo barxadahana

meydad ka buuxiya, oo haddana baxa. Markaasay bexeen
oo magaaladii dad bay ku dhex laayeen. 8 Oo intay dadka
laynayeen oo aan anigu hadhay ayaan wejiga u dhacay, oo
intaan qayliyey ayaan idhi, Sayidow, Rabbiyow, ma waxaad
doonaysaa inaad kuwa reer binu Israa'iil ku hadha oo dhan
ku wada baabbi'isid cadhadaada aad Yeruusaalem ku dul
shubayso? 9 Markaasuu igu yidhi, Dadka dalka Israa'iil
iyo dadka dalka Yahuudahba xumaantoodu aad iyo aad
bay u badan tahay, oo dalkiina dhiig baa ka buuxsamay,
oo magaaladiina qalloocnaan baa ka buuxsantay, waayo,
waxay isyidhaahdaan, Rabbigu dhulka wuu ka tegey, oo
Rabbigu waxba ma arko. 10 Oo aniguna indhahaygu uma
tudhi doonaan, oo innaba uma aan nixi doono, laakiinse
jidkooda ayaan madaxooda kaga abaalmarin doonaa. 11
Oo bal eeg, ninkii dharkii wanaagsanaa qabay oo geeska
khadka dhinaciisa ku sitay ayaa war keenay, oo wuxuu yidhi,
Wixii aad igu amartay ayaan sameeyey.

**10** Markaasaan wax fiiriyey, oo cirkii madaxii keruubiimta
ka korreeyey waxaa ka muuqday wax dhagax safayr u
ekaa, oo muuqashadiisu carshi u eg tahay. 2 Markaasuu
la hadlay ninkii dharkii wanaagsanaa qabay, oo wuxuu ku
yidhi, Waxaad kala dhex martaa giraangiraha iyo xataa
keruubka hoostiisa, oo markaas labadaada gacmood ka soo
buuxi dhuxulo dab ah oo aad keruubiimta dhexdooda ka
soo cantoobiso, oo waxaad ku dul daadisaa magaalada.
Oo isna wuu dhex maray anigoo indhaha ku haya. 3
Haddaba keruubiimtu waxay taagnaayeen guriga dhankiisa
midigta markuu ninkii gudaha galay, oo barxaddii hoose
waxaa ka buuxsantay daruur. 4 Markaasaa ammaantii
Rabbigu keruubkii marinkii guriga uga kacday, oo gurigiina
waxaa ka buuxsantay daruurtii, oo barxaddiina waxaa ka
buuxsamay dhalaalkii ammaanta Rabbiga. 5 Oo sanqadhii
baalashii keruubiimtana waxaa laga maqlay tan iyo xataa
barxaddii dibadda, sidii markuu Ilaaha Qaadirka ahu hadlo.
6 Oo markuu amray ninkii dharka wanaagsanaa qabay
oo uu ku yidhi, Giraangiraha dhexdooda iyo keruubiimta
dhexdooda dab ka soo qaad, markaasuu dhex galay oo
wuxuu istaagay giraangir dhinaceed. 7 Oo keruubkii wuxuu
gacantiisii u fidiyey dabkii keruubiimta dhexdooda yiil, oo
intuu wuxoogaa ka soo qaaday ayuu gacantii kii dharka
wanaagsanaa qabay ku riday, oo isaguna intuu soo qaaday
ayuu baxay. 8 Oo keruubiimtii waxaa ka muuqday wax nin
gacantiis u eg oo baalashooda hoosta uga yaal. 9 Oo intaan
wax fiirinayay waxaa ii muuqday afartii giraangirood oo
keruubiimta dhinac yiil, oo giraangir baa keruub dhinac tiil,
oo giraangir kalena keruub kalay dhinac tiil, oo giraangiraha
muuqashadooduna waxay u ekayd dhagax berullos oo kale.
10 Oo afartooduba isku muuqashay lahaayeen, oo waxaa la
mooday sidii giraangir giraangir kale ku dhex jirta. 11 Oo
markay socdeenna waxay ku socdeen afartoodii dhinacba,
oo innaba ma ay leexleexan markay socdeen, laakiinse
meeshii madaxoodu u sii jeeday ayay u raaceen, oo innaba
ma ay leexleexan markay socdeen. 12 Oo jidhkooda oo
dhan, iyo dhabarkooda, iyo gacmahooda, iyo baalashooda,
iyo giraangirihii afartooda la socdayba waxay ahaayeen
indho miidhan oo hareerahooda ku wareegsan. 13 Oo
giraangirihiina anigoo maqlaya ayaa lagu magacaabay
giraangiraha warwareega. 14 Oo mid kastaaba wuxuu lahaa
afar weji. Wejigii kowaad wuxuu ahaa weji keruub, oo
wejigii labaadna wuxuu ahaa weji nin, oo kii saddexaadna
wuxuu ahaa weji libaax, oo kii afraadna wuxuu ahaa weji
gorgor. 15 Keruubiimtii kor bay isu qaadeen. Kuwaasu
waxay ahaayeen xayawaankii aan Webi Kebaar agtiisa ku
arkay. 16 Keruubiimtu markay socdeenba giraangiruhuna
way dhinac socdeen, oo markii keruubiimtu ay baalashooda
kor u qaadeen inay dhulka kor isaga qaadaan aawadeed,
isla giraangirahaasu dhinacoodii kama ay leexan. 17 Oo
markay istaageen, kuwaasuna way istaageen, oo markay
kor isu qaadeenna, kuwaasuna kor bay isu qaadeen,
waayo, xayawaanka naftoodu iyagay ku jirtay. 18 Markaasaa
ammaantii Rabbigu marinka gurigay ka kacday oo waxay
istaagtay meel keruubiimtii ka korraysa. 19 Oo keruubiimtiina
baalashooday kor u qaadeen oo anigoo indhaha ku haya ayay
dhulka kor isaga qaadeen, oo markay bexeen giraangirihiina
way dhinac socdeen, oo waxay ag istaageen albaabkii
iridda bari ee guriga Rabbiga, oo Ilaaha reer binu Israa'iil
ammaantiisiina iyagay ka korraysay. 20 Kuwaasu waxay
ahaayeen xayawaankii aan ku arkay Ilaaha reer binu Israa'iil
hoostiisa iyagoo Webi Kebaar agtiisa jooga, oo waxaan iqiin
inay keruubiim yihiin. 21 Midkood kastaaba wuxuu lahaa
afar weji, oo midkood kastaaba wuxuu lahaa afar baal, oo
baalashooda hoostoodana waxaa ku yiil wax nin gacmihiis u
eg. 22 Oo wejiyadooduna waxay ahaayeen isla wejiyadii aan
Webi Kebaar agtiisa ku arkay, oo muuqashadooda iyo iyaga
qudhooduba isku mid bay ahaayeen, oo midkood kastaaba
hortiisuu qummaati ugu socday.

**11** Oo weliba ruuxii baa kor ii qaaday oo wuxuu i geeyey
iriddii bari ee guriga Rabbiga oo xagga bari u sii
jeedday, oo iridda albaabkeedii waxaan ku arkay shan iyo
labaatan nin, oo waxaan dhexdooda ku arkay Ya'asanyaah
ina Casuur iyo Felatyaah ina Benaayaah, oo labaduba
waxay ahaayeen dadka amiirradoodii. 2 Oo markaasuu igu

yidhi, Wiilka Aadamow, kuwaasu waa nimanka xumaanta
hindisa, oo magaaladan dhexdeeda talo shar ah kaga
taliya. 3 Oo waxay yidhaahdaan, Wakhtiga guryo la dhiso
ma dhowa. Magaaladanu waa dheri weyn oo innaguna
waxaynu nahay hilibkii. 4 Sidaas daraaddeed iyaga wax ka
sii sheeg, Wiilka Aadamow, wax sii sheeg. 5 Markaasaa
Ruuxii Rabbigu igu soo degay, oo wuxuu igu yidhi, Waxaad
tidhaahdaa, Rabbigu wuxuu leeyahay, Reer binu Israa'iilow,
sidaasaad istidhaahdeen, waayo, waxyaalaha maankiinna
soo gala waan ogahay. 6 Magaaladan dhexdeeda waxaad
ku badiseen kuwiinnii la laayay, oo jidadkeedana kuwii la
laayay waad ka buuxiseen. 7 Sidaas daraaddeed Sayidka
Rabbiga ahu wuxuu leeyahay, Meydadkiinna aad dhexdeeda
dhigteen ayaa hilibka ah oo magaaladanuna waa dheriga
weyn, laakiinse dhexdeedaa laydinka soo bixin doonaa. 8
Sayidka Rabbiga ahu wuxuu leeyahay, Idinku seef baad ka
cabsateen, oo seef baan idinku soo dayn doonaa. 9 Oo
dhexdeedaan idinka soo bixin doonaa, oo waxaan idinku
ridi doonaa shisheeyayaal gacmahooda, oo dhexdiinnana
xukummo baan ku samayn doonaa. 10 Seef baad ku le'an
doontaan, oo soohdinta dalka reer binu Israa'iil ayaan idinku
xukumi doonaa, oo waxaad ogaan doontaan inaan anigu
Rabbiga ahay. 11 Magaaladanu dherigiinna ma ay ahaan
doonto, oo idinkuna hilibka ku dhex jira ma aad ahaan
doontaan, laakiinse soohdinta dalka reer binu Israa'iil ayaan
idinku xukumi doonaa. 12 Oo waxaad ogaan doontaan
inaan anigu Rabbiga ahay, waayo, qaynuunnadaydii kuma
aydaan socon, oo xukummadaydiina ma aydaan samayn,
laakiinse waxaad samayseen sidii xukummadii quruumaha
oo idinku wareegsanu ay samayn jireen. 13 Oo intaan
wax sii sheegayay ayaa Felatyaah ina Benaayaah dhintay.
Markaasaan wejiga u dhacay oo cod dheer baan ku qayliyey,
oo idhi, Sayidow, Rabbiyow, ma waxaad doonaysaa inaad
inta reer binu Israa'iil ka hadhay wada baabbi'iso? 14
Markaasaa eraygii Rabbigu ii yimid isagoo leh, 15 Wiilka
Aadamow, walaalahaa oo ah walaalahaaga runta ah, iyo
dadka xigaalkaaga ah, iyo kulli reer binu Israa'iil oo dhammu
waa kuwii dadka Yeruusaalem degganu ay ku yidhaahdeen,
Idinku Rabbiga ka fogaada. Dalkan annagaa dhaxal naloo
siiyey. 16 Sidaas daraaddeed waxaad tidhaahdaa, Sayidka
Rabbiga ahu wuxuu leeyahay, In kastoo aan iyaga quruumaha
ku dhex fogeeyey, iyo in kastoo aan waddammada ku kala
dhex firdhiyey, weliba waxaan iyaga waddammadii ay tageen
ugu ahaan doonaa meel quduus ah. 17 Sidaas daraaddeed
waxaad tidhaahdaa, Sayidka Rabbiga ahu wuxuu leeyahay,
Waxaan idinka soo ururin doonaa dadyowga dhexdooda,
oo waddammadii laydinku kala firdhiyey ayaan idinka soo
shirin doonaa, oo waxaan idin siin doonaa dalka reer
binu Israa'iil. 18 Oo iyagu halkaasay iman doonaan, oo
waxay halkaas ka fogayn doonaan waxyaalaha la naco
oo dhan iyo waxyaalaha karaahiyada ah oo dhanba. 19
Oo waxaan iyaga siin doonaa qalbi keliya, oo waxaan
gelin doonaa ruux cusub, oo qalbigii dhagaxa ahaana
jidhkooda waan ka dhex bixin doonaa, oo waxaan siin
doonaa qalbi jiidh ah, 20 si ay iyagu qaynuunnadayda ugu
socdaan, oo ay amarradayda u xajiyaan oo ay u sameeyaan,
oo waxay ahaan doonaan dadkayga, aniguna Ilaahooda
ayaan ahaan doonaa. 21 Laakiinse Sayidka Rabbiga ahu
wuxuu leeyahay, Kuwa qalbigoodu daba socdo waxyaalaha
la naca iyo waxyaalahooda karaahiyada ahba jidkooda
ayaan madaxooda kaga abaalmarin doonaa. 22 Markaasaa
keruubiimtii baalashooda kor u qaadeen, oo giraangirihiina
way dhinac yiilleen, oo ammaantii Ilaaha reer binu Israa'iilna
iyagay ka korraysay. 23 Markaasaa ammaantii Rabbigu
magaalada dhexdeedii ka kacday, oo waxay kor istaagtay
buurta magaalada dhankeeda bari ku taal. 24 Oo markaasaa
Ruuxii kor ii qaaday, oo Ruuxii Ilaah wuxuu wixii lay tusay igu
keenay dalkii Kalday iyo maxaabiistii meeshaas joogtay. Oo
markaasaa wixii lay tusay oo aan arkay kor iiga bexeen. 25
Markaasaan kuwii maxaabiista ahaa u sheegay waxyaalihii
uu Rabbigu i tusay oo dhan.

12 Oo haddana Eraygii Rabbiga ayaa ii yimid isagoo leh,
2 Wiilka Aadamow, waxaad dhex deggan tahay reer
caasiyoobay, oo leh indho ay wax ku fiiriyaan laakiinse
aan waxba arkin, oo leh dhego ay wax ku dhegaystaanna
laakiinse aan waxba maqlin, waayo, waa reer caasiyoobay.
3 Sidaas daraaddeed Wiilka Aadamow, alaabtaada inaad
guurtid u diyaarso, oo maalin cad guur iyagoo indhaha kugu
haya, oo waa inaad meeshaada ka guurtaa oo aad meel
kale u guurtaa iyagoo indhaha kugu haya; waxay noqon
kartaa inay ka fiirsadaan, in kastoo ay reer caasiyoobay
yihiin. 4 Oo waa inaad alaabtaada maalin cad soo bixisaa
sida alaab lala guurayo iyagoo indhaha kugu haya, oo waa
inaad makhribkii ambabbaxdaa sida kuwo masaafuris u
bixitimaya iyagoo indhaha kugu haya. 5 Oo iyagoo indhaha
kugu haya derbiga dalooli oo alaabta halkaas ka soo bixi.
6 Iyagoo indhaha kugu haya waa inaad alaabta garbaha
ku qaadataa oo la ambabbaxdaa markay gudcur tahay. Oo
wejigaagana waa inaad deddaa si aadan dhulka u arag,
waayo, calaamad baan reer binu Israa'iil kaaga dhigay. 7 Oo
aniguna sidii laygu amray ayaan sameeyey, oo alaabtaydii
maalin cad baan soo bixiyey, sidii alaab lala guurayo oo kale,
oo markay makhribkii ahayd ayaan derbigii gacantayda ku

dalooliyey, oo iyadoo gudcur ah ayaan dibadda u soo saaray,
oo iyagoo indhaha igu haya ayaan garbaha ku qaatay. 8 Oo
subaxdii dambe ayaa eraygii Rabbigu ii yimid isagoo leh, 9
Wiilka Aadamow, reerkii caasiyoobay oo reer binu Israa'iil
ah sow kuguma ay odhan, War maxaad samaynaysaa? 10
Waxaad iyaga ku tidhaahdaa, Sayidka Rabbiga ahu wuxuu
leeyahay, Warkan culusu wuxuu ku saabsan yahay amiirka
Yeruusaalem jooga iyo reer binu Israa'iilka dhexdeeda jooga
oo dhanba. 11 Waxaad iyaga ku tidhaahdaa, Anigu calaamad
baan idiin ahay. Sidaan sameeyey oo kale ayaa iyaga lagu
samayn doonaa. Iyagu masaafurisyo bay noqon doonaan
oo maxaabiisnimay geli doonaan. 12 Oo amiirka iyaga
dhex joogaana iyadoo gudcur ah ayuu garbaha wax ku
qaadan doonaa, wuuna ambabbixi doonaa. Derbigay daloolin
doonaan si ay halkaas alaabta ugala baxaan aawadeed,
oo isna wejiguu dedan doonaa si uusan indhihiisa dhulka
ugu arag. 13 Oo weliba aniguna shabaggaygaan ku kor
kala bixin doonaa, oo dabinkaygaa lagu soo qaban doonaa,
oo waxaan isaga keeni doonaa Baabuloon iyo dalka reer
Kaldayiin, oo weliba ma uu arki doono, in kastoo uu halkaas
ku dhiman doono. 14 Oo kuwa hareerihiisa u jooga inay isaga
caawiyaan oo dhanna waan u kala firdhin doonaa xagga
dabaylaha oo dhan iyaga iyo guutooyinkiisa oo dhanba, oo
seef baan ka daba qaadan doonaa. 15 Oo iyaguna waxay
ogaan doonaan inaan anigu Rabbiga ahay, markaan iyaga
quruumaha ku kala dhex eryi doono, oo aan waddammada
ku kala firdhin doono. 16 Laakiinse wuxoogaa yar oo iyaga
ka mid ah ayaan ka caymin doonaa seefta, iyo abaarta,
iyo belaayada si ay waxyaalahooda karaahiyada ah oo
dhan uga dhex sheegaan quruumaha oo dhan meel alla
meeshay tagaanba, oo waxay ogaan doonaan inaan anigu
Rabbiga ahay. 17 Oo haddana Eraygii Rabbiga ayaa ii yimid
isagoo leh, 18 Wiilka Aadamow, kibistaada naxdin ku cun,
oo biyahaagana gariirid iyo welwel ku cab, 19 oo dadka
dalka degganna waxaad ku tidhaahdaa, Sayidka Rabbiga
ahu wuxuu dadka deggan Yeruusaalem iyo dalka reer binu
Israa'iilba ka leeyahay, Iyagu kibistooda welwel bay ku cuni
doonaan, oo biyahoodana yaab bay ku cabbi doonaan, si
uu dalkoodu uga cidloobo waxa dhexdiisa jooga oo dhan,
waana dulmiga kuwa dhexdiisa deggan oo dhammu ay
sameeyaan aawadiis. 20 Oo magaalooyinka la deggan yahay
way baabbi'i doonaan, oo dalkuna wuu cidloobi doonaa,
oo idinkuna waxaad ogaan doontaan inaan anigu Rabbiga
ahay. 21 Oo haddana Eraygii Rabbiga ayaa ii yimid isagoo
leh, 22 Wiilka Aadamow, waa maxay hadalkan aad dalka
reer binu Israa'iil ku haysataan, kaasoo leh, Wakhtigii waa sii
dheeraaday oo muujin kastaaba way beenowday? 23 Oo
haddaba waxaad iyaga ku tidhaahdaa, Sayidka Rabbiga
ahu wuxuu leeyahay, Anigu hadalkaas waan joojin doonaa,
oo mar dambena dalka reer binu Israa'iil sidaas loogama
dhex hadli doono, laakiinse waxaad iyaga ku tidhaahdaa,
Wakhtigii waa soo dhow yahay, oo muujin kastaaba way
rumoobi doontaa. 24 Waayo, innaba mar dambe reer binu
Israa'iil lagama dhex heli doono muujin been ah iyo faal
sasab ah. 25 Maxaa yeelay, anaa Rabbiga ah. Anigu waan
hadli doonaa, oo eraygii aan ku hadlaana wuu oofi doonaa.
Mar dambena dib looma sii dhigi doono waayo, Sayidka
Rabbiga ahu wuxuu leeyahay, Reerka caasiyoobayow,
wakhtigiinna ayaan erayga odhan doonaa, oo weliba waan
oofin doonaa. 26 Oo haddana Eraygii Rabbiga ayaa ii yimid
isagoo leh, 27 Wiilka Aadamow, bal eeg, kuwa reer binu
Israa'iil waxay yidhaahdaan, Muujinta uu arkaa waa mid
wakhtiyo badan ka dambaysa, oo isagu wuxuu wax ka sii
sheegayaa wakhtiyo fog. 28 Sidaas daraaddeed bal waxaad
iyaga ku tidhaahdaa, Sayidka Rabbiga ahu wuxuu leeyahay,
Erayadayda midkoodna mar dambe dib looma sii dhigi
doono, laakiinse eraygii aan ku hadlaaba wuu oofi doonaa,
ayaa Sayidka Rabbiga ahu leeyahay.

**13** Oo haddana Eraygii Rabbiga ayaa ii yimid isagoo leh, 2
Wiilka Aadamow, waxaad wax ka sii sheegtaa nebiyada
reer binu Israa'iil oo wax sheega, oo kuwa qalbigooda
wax ka sii sheega waxaad ku tidhaahdaa, Erayga Rabbiga
maqla: 3 Sayidka Rabbiga ahu wuxuu leeyahay, Waxaa
iska hoogay nebiyada nacasyada ah oo qalbigooda iska
daba gala, iyagoo aan waxba arkin. 4 Reer binu Israa'iilow,
nebiyadiinnu waxay la mid ahaayeen dawacooyinka meelaha
baabba'a ah jooga. 5 Idinku meelihii jajabnaa ma aydaan
u kicin, oo heeraarkiina reer binu Israa'iil uma aydaan
adkayn, si maalinta Rabbiga dagaalka loogu istaago. 6 Iyagu
waxay arkeen wax aan waxba ahayn iyo faal been ah, oo
waxay yidhaahdaan, Rabbigu saasuu leeyahay, iyadoo aan
Rabbigu iyaga soo dirin. Oo waxay kuwa kale ka yeeleen
inay sii rajeeyaan in eraygaas la xaqiijin doono. 7 Miyaydaan
muujin been ah arkin, oo miyaydaan faal been ah ku hadlin,
markaad tidhaahdaan Rabbigu saasuu leeyahay, in kastoo
aanan idinla hadlin? 8 Sidaas daraaddeed Sayidka Rabbiga
ahu wuxuu leeyahay, Bal ogaada anigu col baan idinku
ahay, maxaa yeelay, idinku wax aan waxba ahayn ayaad ku
hadasheen oo wax been ah baad aragteen ayaa Sayidka
Rabbiga ahu leeyahay. 9 Oo gacantayduna waxay col ku
noqon doontaa nebiyada waxa aan waxba ahayn arka, oo
waxyaalaha beenta ah ka faaliya. Iyagu dadkayga shirkiisa
ma ay dhex joogi doonaan, oo qorniinka reer binu Israa'iilna

laguma qori doono, oo dalka reer binu Israa'iilna ma ay geli
doonaan, oo idinkuna waxaad ogaan doontaan inaan anigu
ahay Sayidka Rabbiga ah. **10** Waxyaalahaasu way dhici
doonaan, maxaa yeelay, iyagu dadkaygay sireen, iyagoo
leh, Waa nabad, iyadoo aan innaba nabadu jirin, oo markii
derbi la dhiso, bal eeg, waxay ku malaasaan dhoobo aan
nuurad lahayn. **11** Kuwa dhoobada aan nuuradda lahayn
wax ku malaasa waxaad u sheegtaa inuu derbigaasu soo
dhici doono, waxaana jiri doona roob daad weyn. Kuwiinnan
roobdhagaxyaale waaweyn ahow, waad soo di'i doontaan, oo
dabayl duufaan leh ayaa kala ridi doonta derbigaas. **12** Bal
ogaada, markii derbigu dhaco sow laydinkuma odhan doono,
War meeday dhoobadii aad wax ku malaasteen? **13** Sidaas
daraaddeed Sayidka Rabbiga ahu wuxuu leeyahay, Anigoo
cadhaysan ayaan dabayl duufaan leh ku dumin doonaa.
Oo waxaa xanaaqayga ku iman doona roob daad weyn iyo
roobdhagaxyaale waaweyn oo cadhadayda ku baabbi'iya.
**14** Sidaasaan derbigii aad dhoobada aan nuuradda lahayn
ku malaasteen u dumin doonaa, oo dhulkaan ku ridi doonaa,
oo aasaaskiisana waa la bannayn doonaa. Wuu soo dhici
doonaa, oo dhexdiisaa laydinku wada baabbi'in doonaa, oo
markaasaad ogaan doontaan inaan anigu Rabbiga ahay. **15**
Oo sidaasaan cadhadayda ugu dhammayn doonaa derbigii
iyo kuwii dhoobada aan nuuradda lahayn ku malaasayba, oo
waxaan idinku odhan doonaa, Imminka derbigii iyo kuwii
malaasayba ma jiraan. **16** Kuwaasu waxaa weeye nebiyada
reer binu Israa'iil oo Yeruusaalem wax ka sii sheega, oo
iyada muujin nabdeed u arka, iyadoo aan nabadu jirin,
ayaa Sayidka Rabbiga ahu leeyahay. **17** Wiilka Aadamow,
wejigaaga u jeedi gabdhaha dadkaaga oo qalbigooda wax ka
sii sheega, oo adiguna waa inaad iyaga wax ka sii sheegtaa.
**18** Oo waxaad ku tidhaahdaa, Sayidka Rabbiga ahu wuxuu
leeyahay, Waxaa iska hoogay naagaha gacmaha oo dhan
xirsiyo ku sameeya oo masarro madaxa dadka dherer
kastaba leh u sameeya si ay dad naftiis u ugaadhsadaan!
Ma waxaad ugaadhsanaysaan dadkayga naftiisa, oo ma
waxaad badbaadinaysaan kuwiinna naftooda? **19** Waxaad
dadkaygii iigu dhex nijaasayseen cantoobooyin shaciir ah
iyo dhawr xabbadood oo kibis ah daraaddood, si aad
nafaha aan dhiman lahayn u dishaan, oo aad nafaha
aan sii noolaan lahayn badbaadisaan, idinkoo dadkayga
beenta dhegaysta been u sheegaya. **20** Haddaba sidaas
daraaddeed Sayidka Rabbiga ahu wuxuu leeyahay, Anigu
xirsiyadiinna col baan ku ahay, kuwaasoo aad nafaha sida
shimbirro oo kale ugu ugaadhsataan, oo gacmihiinna ayaan
ka gooyn doonaa, oo nafahana waan sii dayn doonaa,
kuwaas oo ah nafihii aad u ugaadhsateen sida shimbirro oo
kale. **21** Oo weliba masarradiinnana waan jeexi doonaa, oo
dadkaygana gacantiinna waan ka samatabbixin doonaa,
oo mar dambena gacantiinna in la ugaadhsado aawadeed
uma soo geli doonaan, oo idinkuna waxaad ogaan doontaan
inaan anigu Rabbiga ahay. **22** Idinku kan xaqa ah been
baad ku qalbi jebiseen, kaasoo aanan anigu qalbi jebin, oo
waxaad sii xoogayseen gacmihii sharrowga si uusan jidkiisa
sharka ah uga soo noqon, oo uusan u badbaadin, **23** sidaas
daraaddeed mar dambe wax aan waxba ahayn ma arki
doontaan, oo faalna ma faalin doontaan, oo dadkayga ayaan
gacantiinna ka samatabbixin doonaa, oo idinkuna waxaad
ogaan doontaan inaan anigu Rabbiga ahay.

**14** Markaasaa waxaa ii yimid qaar odayaashii reer binu
Israa'iil ka mid ah oo hortayday fadhiisteen. **2** Oo
haddana Eraygii Rabbiga ayaa ii yimid isagoo leh, **3**
Wiilka Aadamow, nimankanu qalbigooday sanamyadoodii
dabaggeliyeen, oo wejigoodana waxay hor dhigeen waxa
ay ku turunturoodaan ee xumaantooda ah. Haddaba miyey
waajib igu tahay inaan u jawaabo markay wax i weyddiistaan?
**4** Sidaas daraaddeed iyaga la hadal oo waxaad ku tidhaahdaa,
Sayidka Rabbiga ahu wuxuu leeyahay, Nin kasta oo reer
binu Israa'iil ka mid ah oo sanamkiisa qalbigiisa dabaggeliya,
oo waxa uu ku turunturoodo ee xumaantiisa ahna wejigiisa
hor dhiga, oo haddana nebiga u yimaada, aniga Rabbiga
ah ayaa kii u yimaada u jawaabi doona sida sanamyadiisa
faraha badan, **5** si aan reer binu Israa'iil qalbigooda ugu
qabto, maxaa yeelay, iyagu sanamyadooda aawadood ayay
kulligood iiga shisheeyoobeen. **6** Sidaas daraaddeed waxaad
reer binu Israa'iil ku tidhaahdaa, Sayidka Rabbiga ahu wuxuu
leeyahay, Soo noqda, oo sanamyadiinna ka soo noqda, oo
wejigiinnana waxyaalihiinna karaahiyada ah oo dhan ka sii
jeediya. **7** Waayo, mid kasta oo reer binu Israa'iil ka mid ah
ama mid kasta oo shisheeyayaasha reer binu Israa'iil dhex
deggan ka mid ah oo iska kay sooca, oo sanamyadiisana
qalbigiisa dabaggeliya, oo waxa uu ku turunturoodo ee
xumaantiisa ah wejigiisa hor dhiga, haddana nebiga ugu
yimaada inuu wax i weyddiisto, aniga Rabbiga ah qudhaydaa
u jawaabi doona. **8** Oo ninkaas wejigaygaan u jeedin doonaa,
oo waxaan isaga ka dhigi doonaa yaab iyo calaamad iyo
maahmaah, oo dadkaygaan ka dhex gooyn doonaa, oo
idinkuna waxaad ogaan doontaan inaan anigu Rabbiga ahay.
**9** Oo haddii nebi intuu wax ku hadlo la khiyaaneeyo, nebigaas
aniga Rabbiga ah ayaa khiyaaneeyey, oo gacantaydaan
ku soo kor fidin doonaa, oo dadkayga reer binu Israa'iil
dhexdiisa ayaan ka baabbi'in doonaa. **10** Oo iyana ciqaabta
xumaantooday qaadan doonaan. Nebiga ciqaabtiisuna waxay

ahaan doontaa sidii ciqaabta kan isaga wax weyddiista, 11 si
ayan reer binu Israa'iil mar dambe iiga amban ama ayan
mar dambe xadgudubyadooda ugu nijaasoobin, laakiinse
ay dadkaygii iigu ahaadaan, oo aan aniguna Ilaahooda
ugu noqdo, ayaa Sayidka Rabbiga ahu leeyahay. 12 Oo
haddana Eraygii Rabbiga ayaa ii yimid isagoo leh, 13 Wiilka
Aadamow, marka dalku xadgudub xun iigu dembaabo, oo
aan gacantayda ku soo dul fidiyo, oo aan usha cuntadiisa
jebiyo, oo aan abaar ku soo daayo, oo aan dad iyo duunyaba
ka dhex gooyo, 14 Sayidka Rabbiga ahu wuxuu leeyahay,
xataa haddii saddexdaas nin oo ah Nuux iyo Daanyeel iyo
Ayuub ay dhex joogi lahaayeen, xaqnimadooda waxay ku
samatabbixin lahaayeen naftooda oo keliya. 15 Haddaan
dalka dugaag baas ku soo dhex daayo, oo ay dadka ka
baabbi'iyaan si uu meel cidla ah u noqdo, oo aan ciduna
dugaagga aawadiis u soo dhex marin, 16 xataa hadday
saddexdaas nin dhex joogi lahaayeen, Sayidka Rabbiga
ahu wuxuu leeyahay, Noloshaydaan ku dhaartaye, Wiilal
iyo gabdho toona ma samatabbexeen. Iyaga keligood ayaa
samatabbixi lahaa, laakiinse dalku waa cidloobi lahaa. 17
Amase haddaan dalkaas seef ku soo daayo, oo aan ku
idhaahdo, Seefay, dalka dhex mar, si aan dhexdiisa dad
iyo duunyaba uga wada gooyo, 18 Sayidka Rabbiga ahu
wuxuu leeyahay, Noloshaydaan ku dhaartaye, Xataa hadday
saddexdaas nin dhex joogi lahaayeen wiilal iyo gabdho
toona ma samatabbexeen, laakiinse iyagoo keliya ayaa
samatabbixi lahaa. 19 Amase haddaan dalkaas belaayo
ku soo dhex daayo, oo aan cadhadaydana dhiig ugu kor
shubo, si aan dad iyo duunyoba uga gooyo, 20 xataa haddii
Nuux iyo Daanyeel iyo Ayuub ay dhex joogi lahaayeen,
Sayidka Rabbiga ahu wuxuu leeyahay, Noloshaydaan ku
dhaartaye, Wiil iyo gabadh toona ma samatabbexeen,
laakiinse iyagu xaqnimadooda ayay naftooda oo keliya ku
samatabbixin lahaayeen. 21 Waayo, Sayidka Rabbiga ahu
wuxuu leeyahay, Haddaba intee in le'eg bay ka sii darnaan
doontaa markaan Yeruusaalem ku soo daayo afartayda
xukun ee baas, kuwaasoo ah seef, iyo abaar, iyo dugaag
baas, iyo belaayo, si aan dhexdeeda dad iyo duunyoba uga
wada gooyo? 22 Laakiinse bal ogaada, waxaa dhexdeeda
ku hadhi doona kuwa la soo bixin doono, oo wiilal iyo
gabdhoba leh. Oo bal ogaada, idinkay idiin soo bixi doonaan,
oo waxaad arki doontaan jidkooda iyo falimahoodaba, oo
belaayada aan Yeruusaalem ku soo daayay, kuwaasoo ah
xataa waxyaalaha aan iyada ku soo dejiyey oo dhan waa
laydiinka qalbi qabowjin doonaa. 23 Oo markaad jidkooda iyo
falimahoodaba aragtaan way idiin qalbi qabowjin doonaan,
oo Sayidka Rabbiga ahuna wuxuu leeyahay, Idinku waxaad
ogaan doontaan inaanan sababla'aan ugu samayn wixii aan
dhexdeeda ku sameeyey oo dhan.

15 Oo haddana Eraygii Rabbiga ayaa ii yimid isagoo
leh, 2 Wiilka Aadamow, geedka canabku bal muxuu
dhirta kale dheer yahay, amase laanta canabku maxay dhirta
kaynta ku taal dheer tahay? 3 Ma qoryaa laga goostaa in
shuqul lagu samaysto? Miyaase dadku qodob ka goostaa si
ay weel u sudhaan? 4 Bal eeg, xaabo ahaan baa dabka loogu
dhex tuuraa, oo dabka ayaa labadiisa madaxba dhammeeya,
oo dhexdiisuna way gubataa. Miyuu in shuqul lagu qabsado
wax u taraa? 5 Bal eeg, markuu dhamaa shuqulna waxba
uma tarayn, haddaba bal intee buu ka sii liitaa haatan oo
uu dab dhammeeyey oo uu gubtay? 6 Sidaas daraaddeed
Sayidka Rabbiga ahu wuxuu leeyahay, Sidii geedka canabka
ah oo ku dhex yaal dhirta kaynta, oo aan xaabo ahaan dabka
u siiyey, sidaas oo kale ayaan dadka Yeruusaalem deggan
u siin doonaa. 7 Oo wejigaygaan u soo jeedin doonaa.
Dabkay ka dhex bixi doonaan laakiinse dabku wuu baabbi'in
doonaa; oo idinkuna waxaad ogaan doontaan inaan anigu
Rabbiga ahay, markaan iyaga wejigayga u jeediyo. 8 Oo
Sayidka Rabbiga ahu wuxuu leeyahay, Dalkaan cidla ka
dhigi doonaa, maxaa yeelay, iyagu way xadgudbeen.

16 Oo haddana mar kale Eraygii Rabbiga ayaa ii
yimid isagoo leh, 2 Wiilka Aadamow, Yeruusaalem
waxyaalaheeda karaahiyada ah ogeysii, 3 oo waxaad ku
tidhaahdaa, Sayidka Rabbiga ahu wuxuu Yeruusaalem ku
leeyahay, Jinsiyadaada iyo dhalashadaaduba waa dalka reer
Kancaan. Aabbahaa wuxuu ahaa reer Amor, oo hooyadaana
waxay ahayd reer Xeed. 4 Oo dhalashadaadii iyo maalintii
aad dhalatay xudduntaadii lama gooyn, oo biyana laguguma
maydhin si aad nadiif u noqotid. Innaba laguma cusbayn,
oo innaba waxba laguguma duudduubin. 5 Iluna kuuma
ay nixin inay waxyaalahaas kuu samayso, ama inay kuu
roonaato, laakiinse maalintii aad dhalatay ayaa berrinka
bannaan lagugu xooray, waayo, qofnimadaadu waxay ahayd
wax la quudhsado. 6 Oo markaan ku soo ag maray oo aan
arkay adigoo dhiiggaagii ku nijaasoobay ayaan kugu idhi,
Adigoo dhiiggaagii ku dhex jira, noolow. Adigoo dhiiggaagii
ku dhex jira ayaan waxaan kugu idhi, Noolow! 7 Oo waxaan
kaa dhigay inaad sida biqilka duurka oo kale u badatid,
waanad korodhay oo sii weynaatay, oo waxaad noqotay
wax qurux badan, waanad naaso keentay, oo timahaagiina
way bexeen, in kastoo aad qaawanayd oo aanad dednayn.
8 Haddaba markaan ku soo ag maray, oo aan ku fiiriyey,
wakhtigaagu wuxuu ahaa wakhtigii caashaqa, oo waxaan
kugu deday macawistaydii, oo cawradaadiina waan daboolay,

oo weliba waan kuu dhaartay oo axdi kula dhigtay, oo taydii
baad noqotay, ayaa Sayidka Rabbiga ahu leeyahay. 9 Oo
markaasaan biyo kugu maydhay, oo dhiiggaagiina waan kaa
wada dhaqay, oo saliid baan kugu subkay. 10 Oo weliba
dhar daabac leh ayaan kuu xidhay, oo waxaan kuu geliyey
kabo adhidibadeed hargahood laga sameeyey, oo dhexdana
maro wanaagsan baan kuugu xidhay, oo xariir baan kuu
hagoojiyey. 11 Oo weliba wax baan kugu sharraxay, oo
gacmahana jijimmo baan kuu geliyey, oo qoortana silsilad
baan kuu sudhay. 12 Oo sangelis baan kuu sudhay, oo
dhegahaagana hilqado baan ka lulay, oo madaxana taaj
qurux badan baan kuu saaray. 13 Sidaasaa dahab iyo
lacag lagugu sharraxay, dharkaaguna wuxuu ahaa dhar
wanaagsan, iyo xariir, iyo dhar daabac leh. Oo waxaad
cuntay daqiiq wanaagsan, iyo malab iyo saliid. Oo aad iyo
aad baad u qurux badnayd, oo boqorad baad noqotay. 14 Oo
quruxdaada aawadeed ayaa warkaagii quruumaha ku dhex
faafay, waayo, Sayidka Rabbiga ahu wuxuu leeyahay, Waxay
ku dhammaystirantay haybaddaydii aan ku dul saaray.
15 Laakiinse quruxdaadaad isku hallaysay, oo warkaagii
faafay aawadiis ayaad u dhillowday, oo dhillanimadaadiina
waxaad u badisay mid alla midkii ku soo ag marayba, oo
waad isu dhiibtay. 16 Oo dharkaagiina waad iska furtay, oo
meelo sarsare ayaad samaysatay oo waxaad ku sharraxday
marooyin midabyo badan, oo halkaasaad ku dhillaysatay.
Waxyaalahaas oo kale ma jirin, oo weligood ma ay noqon
doonaan. 17 Oo weliba waxaad qaadatay waxyaalahaagii
quruxdasanaa oo dahabkayga iyo lacagtayda ahaa oo aan
ku siiyey, oo waxaad ka samaysatay sanamyo nimeed, oo
iyagii baad la dhillowday. 18 Oo dharkaagii daabaca lahaa
intaad iska furtay ayaad iyagii huwisay, oo saliiddaydii iyo
fooxaygiina iyagaad hor dhigtay. 19 Oo cuntadaydii aan ku
siiyey, oo ahayd daqiiqda, iyo saliidda iyo malabka, oo aan
kugu quudiyeyna iyagaad hor dhigtay oo aad caraf udgoon
uga dhigtay, oo sidaasay ahayd, ayaa Sayidka Rabbiga ahu
leeyahay. 20 Oo weliba wiilashaadii iyo gabdhahaagii aad
ii dhashayna allabari ahaan baad iyaga ugu bixisay in la
cuno aawadeed. Dhillanimadaadu ma wax yar bay ahayd
21 inaad carruurtayda gowracdid, oo aad iyaga u bixisid in
dab loo dhex marsiiyo sanamyadaada aawadood? 22 Oo
weliba intaad ku dhex jirtay waxyaalahaagii karaahiyada iyo
dhillanimada ahaa marna sooma aad xusuusan wakhtigii
yaraantaada, markaad qaawanayd oo aadan dednayn, oo
aad dhiiggaaga ku dhex nijaasnayd. 23 (Sayidka Rabbiga
ahu wuxuu leeyahay, Adigaa iska hoogay, oo hoogay.)
Oo xumaantaadii oo dhan dabadeed 24 waxaad dhisatay
meel qudbad ah, oo meel sare oo jid kastaba ku dhex
taal ayaad samaysatay. 25 Meeshaadii sare waxaad ka
dhisatay madaxa jid kasta, oo quruxdaadiina waxaad ka
dhigtay wax la karhay, oo waxaad lugaha u kala wadhay
ku alla kii ku soo ag marayba, oo dhillanimadaadiina
waad sii badisay. 26 Oo weliba waxaad ka sinaysatay
Masriyiinta derisyadaada ah, oo buurbuuran, oo intaad
dhillanimadaadii si badisay ayaad iga cadhaysiisay. 27
Sidaas daraaddeed gacantaydaan kugu soo dul fidiyey,
oo cuntadaadii caadiga ahaydna waan kaa dhimay, oo
waxaan gacanta kuu geliyey kuwa ku neceb doonistooda,
kuwaasoo ah gabdhaha reer Falastiin oo jidkaaga sharka ah
ka ceeboobay. 28 Weliba waxaad ka dhillaysatay kuwa reer
Ashuur, maxaa yeelay, waad kacsi beeli weyday, haddana
iyaga waad ka dhillaysatay, oo weliba waad ka dhergi
weyday. 29 Oo weliba dhillanimadaadii waad ku sii badisay
dalka reer Kancaan, iyo tan iyo dalka Kalday, oo weliba
waxaas waad ka dhergi weyday. 30 Sayidka Rabbiga ahu
wuxuu leeyahay, Qalbigaagu taag yaraa markaad samaysid
waxyaalahaas oo dhan, waxaas oo ah dhillo caasiyad ah
shuqulkeed! 31 Oo jid kasta madaxiisa waxaad ka dhisataa
qudbad, oo jid kastana waxaad ka samaysataa meel sare,
oo weliba ma aadan ahayn sidii dhillo oo kale, waayo, adigu
kirada waad quudhsataa. 32 Waxaad la mid tahay naag
nin leh oo sinaysata oo niman qalaad ninkeeda uga hor
marta! 33 Iyagu dhillo kasta hadiyad bay siiyaan, laakiinse
adigu waxaad hadiyadahaaga siisaa kuwa ku caashaqa
oo dhan, oo laaluush baad u siisaa inay dhinac kasta
kaaga yimaadaan dhillanimadaada aawadeed. 34 Oo adigu
naagaha kale waad ka duwan tahay xagga dhillanimadaada,
waayo, laguuma soo raaco in lagaa sinaysto aawadeed,
oo kiro baad u siisaa, iyadoo aan ciduna kiro ku siin, oo
sidaas daraaddeed waad ka duwan tahay dhillooyinka kale
oo dhan. 35 Haddaba dhillo yahay, bal erayga Rabbiga
maqal: 36 Sayidka Rabbiga ahu wuxuu leeyahay, Nijaastaadii
way shubantay, oo cawradaadiina daahaa lagaga qaaday
dhillanimadaadii aad kuwii ku caashaqay ka dhillaysanaysay,
iyo sanamyada waxyaalahaaga karaahiyada ah oo dhan,
iyo dhiiggii carruurtaada oo aad iyaga siisay. 37 Haddaba
sidaas daraaddeed waxaan soo wada ururin doonaa kuwii
ku caashaqay oo aad la raaxaysatay oo dhan, iyo kuwa
aad jeclaatay oo dhan, iyo kuwa aad necbaatay oo dhan.
Kulligood dhinac kastaan kaaga soo ururin doonaa, oo
cawradaadana iyagaan daaha uga qaadi doonaa, si ay
cawradaada oo dhan u arkaan. 38 Oo waxaan kuu xukumi
doonaa sida naagaha raggooda ka dhillooba iyo kuwa dhiigga
daadiya loo xukumo oo kale; oo waxaan kugu ridi doonaa
dhiigga cadhada iyo masayrka. 39 Oo weliba waxaan kugu

ridi doonaa gacantooda, oo iyaguna qudbaddaada way dumin
doonaan, oo meelahaaga sarsarena way burburin doonaan,
oo weliba dharkay kaa furan doonaan, oo jowharadahaaga
qurxoonna way kaa qaadan doonaan, oo waxay kaa tegi
doonaan adigoo qaawan oo aan dednayn. 40 Oo weliba
guutay kugu kicin doonaan, wayna ku dhagxin doonaan, oo
seefahooday kugu mudhbixin doonaan. 41 Oo guryahaagana
dab bay ku gubi doonaan, oo iyadoo ay naago badanu
indhaha kugu hayaan ayay xukummo kugu samayn doonaan,
oo aniguna waxaan kaa dhigi doonaa inaad dhillaysiga ka
joogsatid, oo mar dambe kiro ma aad bixin doontid. 42
Sidaasaan cadhadayda xaggaaga ku dhammaystiri doonaa,
oo masayrkayguna wuu kaa tegi doonaa, oo aniguna
waan xasilli doonaa. Oo innaba mar dambe ma aan
xanaaqi doono. 43 Adigu wakhtigii yaraantaada sooma
aadan xusuusan, laakiinse waxyaalahaas oo dhan waad
igaga xanaajisay, oo sidaas daraaddeed ayaan jidkaaga
madaxaaga kaga abaalmarin doonaa, ayaa Sayidka Rabbiga
ahu leeyahay, oo sharkaas waxyaalahaaga karaahiyada
ah oo dhan kuma aad sii dari doontid. 44 Bal ogow, mid
kasta oo maahmaahyo ku maahmaahaaba wuxuu kuugu
maahmaahi doonaa maahmaahyadan isagoo leh, Sida ay
hooyadu tahay ayaa gabadheeduna tahay. 45 Waxaad
tahay gabadhii hooyadaa oo ninkeeda iyo carruurteedaba
nacda, oo weliba waxaad tahay walaashii walaalahaa oo
nimankoodii iyo carruurtoodiiba nacay. Hooyadaa waxay
ahayd reer Xeed, oo aabbahaana wuxuu ahaa reer Amor. 46
Oo walaashaada kaa weynuna waa Samaariya, ta iyada iyo
gabdhaheeduba bidixdaada deggan yihiin, oo walaashaada
kaa yaruna waa Sodom ta iyada iyo gabdhaheeduba
midigtaada deggan yihiin. 47 Jidadkoodii kuma aadan socon
oo waxyaalahoodii karaahiyada ahaa oo kalena ma aadan
samayn, laakiinse taasu wax yar bay kula noqotay, oo iyaga
jidadkaagii oo dhan waad kaga sii darnayd. 48 Sayidka
Rabbiga ahu wuxuu leeyahay, Noloshaydaan ku dhaartaye,
Waxa adiga iyo gabdhahaagu aad samayseen oo kale
walaashaa Sodom iyo gabdhaheeduba ma ay samayn. 49
Bal eeg, walaashaa Sodom dembigeedu sidan buu ahaa.
Iyada iyo gabdhaheeduba waxay lahaayeen kibir, iyo cunto
faro badan, iyo raaxo barwaaqo ah, laakiinse masaakiinta
iyo saboolka baahan gacmahooda ma ay taageeri jirin.
50 Oo weliba iyagu way isla madax weynaadeen, oo
hortayday karaahiyo ku sameeyeen, sidaas daraaddeed
markaan waxaas arkay ayaan fogeeyey. 51 Oo xataa
dembigaaga badhkiis Samaariya ma ay samayn, laakiinse
waxyaalahaaga karaahiyada ah waad ka sii badisay kuweeda,
oo walaalahaana waxaad xaq kaga dhigtay waxyaalahaagii
karaahiyada ahaa oo aad samaysay oo dhan. 52 Bal adigu
ceebow, waayo, walaalahaa waad xukuntay, maxaa yeelay,
waxaad samaysay wax karaahiyadoodii ka sii daran, oo
iyagu way kaa xaq badan yihiin. Haddaba facsharan, oo
ceebow, waayo, waxaad xaq ka dhigtay walaalahaa. 53
Waxaan dib u soo celin doonaa maxaabiistoodii, kuwaas oo
ah maxaabiistii Sodom iyo gabdhaheeda, iyo maxaabiistii
Samaariya iyo gabdhaheeda, iyo maxaabiistaada iyaga dhex
jooga, 54 si aad u ceebowdid, oo aad ugu facsharantid
wixii aad samaysay oo dhan, waayo, waxaad iyaga u
tahay qalbi qabowjis. 55 Markaasaa walaalahaa Sodom
iyo gabdhaheedu ay sidoodii hore ku soo noqon doonaan,
oo Samaariya iyo gabdhaheeduna ay sidoodii hore ku soo
noqon doonaan, oo adiga iyo gabdhahaaguna aad sidiinnii
hore ku soo noqon doontaan. 56 Waayo, walaashaa Sodom
afkaagu kama hadlin waagii aad kibirsanayd, 57 intaan
xumaantaada daaha laga qaadin, sidii markii gabdhaha
Suuriya iyo inta hareerahooda ku wareegsan oo dhan, iyo
xataa gabdhaha reer Falastiin ay ku caayeen iyagoo dhan
kastaba kaa quudhsada. 58 Rabbigu wuxuu leeyahay, Adiga
sharkaagii iyo waxyaalahaagii karaahiyada ahaaba waa
lagugu ciqaabay. 59 Waayo, wuxuu Sayidka Rabbiga ahu
leeyahay, Waxaan kugu samayn doonaa sidaad samaysay oo
kale, waayo, adigu dhaartii waad quudhsatay markaad axdigii
jebisay. 60 Habase ahaatee axdigaygii aan yaraantaadii
kula dhigtay waan soo xusuusan doonaa, oo weliba waxaan
kula samaysan doonaa axdi weligiis ah. 61 Oo markaasaad
jidadkaagii soo xusuusan doontaa, oo waad isku ceeboobi
doontaa markaad qaabbishid walaalahaa, ta kaa weyn iyo
ta kaa yarba, oo inay gabdho kuu noqdaan baan kuu siin
doonaa, laakiinse axdigaaga kugu siin maayo. 62 Aniguna
axdigaygaan kula adkaysan doonaa, oo adiguna waxaad
ogaan doontaa inaan anigu Rabbiga ahay, 63 si aad wax u
soo xusuusatid, oo aad u facsharantid, oo aadan afkaagana
mar dambe u kala qaadin ceebtaada aawadeed, markaan
kaa wada cafiyo wixii aad samaysay oo dhan, ayaa Sayidka
Rabbiga ahu leeyahay.

**17** Oo haddana Eraygii Rabbiga ayaa ii yimid isagoo
leh, 2 Wiilka Aadamow, halxidho, oo reer binu Israa'iil
masaal kula hadal, 3 oo waxaad ku tidhaahdaa, Sayidka
Rabbiga ahu wuxuu leeyahay, Waxaa Lubnaan yimid gorgor
weyn oo baadad waaweyn oo baalashiisu dheerdheer yihiin,
oo baalal badan oo kala midab ah leh, oo wuxuu qaatay
intii ugu sarraysay oo geedka kedarka la yidhaahdo. 4 Oo
wuxuu jaray laamihiisii yaryaraa, ta ugu korraysa, oo dal
baayacmushtar badan geeyey, oo wuxuu dhigay magaalo
baayacmushtariyaal. 5 Markaasuu qaatay iniinihii dalka,

wuuna ku dhex beeray beer wanaagsan, oo wuxuu ag
dhigay biyo badan dhinacood oo u qotomiyey sidii geed
safsaf ah. 6 Oo iyana way kortay, oo waxay noqotay geed
canab ah oo fidsan laakiinse sarajooggiisu gaaban yahay
oo laamihiisu xaggiisa u soo noqdeen, oo xididdadiisuna
isagay ka hooseeyeen, oo saasuu geedcanab u noqday,
oo uu laamo u soo bixiyey, oo uu caleemo cagaar ah u
soo saaray. 7 Oo weliba waxaa kaloo jiray gorgor kale
oo weyn, oo baadad waaweyn, oo baalashiisu ay badan
yihiin, oo bal eeg, geedkan canabka ahu xididdadiisuu
xaggiisa u soo leexiyey, oo laamihiisiina xaggiisuu u soo
bixiyey si uu uga waraabiyo meel ka leexsan meeshii
lagu dhex beeray. 8 Waxaa lagu beeray ciid wanaagsan
oo biyo badan u dhow, si uu laamo u soo bixiyo, oo uu
midho u dhalo, oo uu geedcanab wanaagsan u noqdo
aawadeed. 9 Waxaad ku tidhaahdaa, Sayidka Rabbiga
ahu wuxuu leeyahay, Miyaa geedkaasu liibaani doonaa?
Miyuusan xididdadiisa rujin doonin, oo uusan midhihiisa u
googooyn doonin si uu u engego, oo caleemihiisa cagaarka
ah oo dhammu ay u engegaan, in kastoo aan xoog weyn
amase dad tiro badanu xididdadiisa rujin? 10 In kastoo
la beeray miyuu liibaani doonaa? Oo miyuusan kulligiis
engegi doonin markii dabaysha bari ay taabato? Meeshii
lagu beeray wuu ka engegi doonaa. 11 Oo haddana Eraygii
Rabbiga ayaa ii yimid isagoo leh, 12 Haddaba waxaad reerka
caasiyoobay ku tidhaahdaa, War miyaydaan waxyaalahaas
micnahooda garanayn? Waxaad ku tidhaahdaa, Bal eega,
boqorkii Baabuloon Yeruusaalem buu yimid, oo wuxuu
kaxaystay boqorkeedii iyo amiirradeediiba, oo Baabuloon
buu u watay. 13 Oo boqorka farcankiisiina wuu watay, oo
axdi buu la dhigtay, oo dhaar buu isagii marsaday, oo weliba
wuxuu kaloo kaxaystay dalka raggiisii xoogga badnaa, 14 si
ay boqortooyadu u sii hoosayso, oo ayan marnaba kor isu
qaadin, laakiinse ay u sii taagnaato axdigiisa oo ay dhawrto
aawadiis. 15 Laakiinse isagu wuu ku caasiyoobay markuu
ergooyinkiisii Masar ugu diray si ay isaga u siiyaan fardo iyo
dad faro badan. Miyuu liibaanayaa? Kii waxyaalahaas oo kale
sameeyaa miyuu baxsan doonaa? Amase intuu axdiga jebiyo
miyuu baxsan doonaa? 16 Sayidka Rabbiga ahu wuxuu
leeyahay, Noloshaydaan ku dhaartaye, sida xaqiiqada ah
meesha uu deggan yahay boqorkii isaga boqorka ka dhigay,
oo uu isagu dhaartiisii quudhsaday, oo uu weliba axdigiisii
jebiyey, isaga qudhdiisa ayuu Baabuloon gudaheeda kula
dhiman doonaa. 17 Oo Fircoon iyo ciidankiisa xoogga
badan, iyo guuto badan toona isaga dagaalka kuma ay
taageeri doonaan marka tuulmo la tuulo, oo qalcado la
dhiso si dad badan loo baabbi'iyo. 18 Maxaa yeelay, isagu
dhaartii wuu quudhsaday markuu axdigii jebiyey, oo intuu
gacantiisa ku dhaartay ayuu haddana waxyaalahaas oo
dhan sameeyey, oo sidaas aawadeed innaba ma uu baxsan
doono. 19 Sidaas daraaddeed Sayidka Rabbiga ahu wuxuu
leeyahay, Noloshaydaan ku dhaartaye, sida xaqiiqada ah
dhaartaydii uu quudhsaday iyo axdigaygii uu jebiyey ayaan
madaxiisa kaga abaalmarin doonaa. 20 Oo korkiisaan ku
kala bixin doonaa shabaggayga, oo isagaa dabinkayga lagu
soo qaban doonaa, oo Baabuloon waan keeni doonaa,
oo xadgudubkii uu igu xadgudbay aawadiis ayaan isaga
halkaas kula xaajoon doonaa. 21 Oo kuwiisa qaxay ee
guutooyinkiisa oo dhammuba seef bay ku le'an doonaan, oo
inta ka hadhaana waxay u kala firdhi doonaan qalbadaha oo
dhan, oo markaasaad ogaan doontaan inaan aniga Rabbiga
ahu waxan ku hadlay. 22 Sayidka Rabbiga ahu wuxuu
leeyahay, Weliba waxaan qaadan doonaa geedkedarka
dheer laantiisa ugu sarraysa, oo meel baan ka taagi doonaa,
oo waxaan gooyn doonaa mid curdan ah oo ka mid ah
laamihiisa yaryar oo ugu korreeya, oo waxaan ku dul beeri
doonaa buur dheer oo sare. 23 Buurta dheer oo dalka reer
binu Israa'iil ayaan ku beeri doonaa, oo waxay soo bixin
doontaa laamo, oo midhona way dhali doontaa, oo waxay
noqon doontaa geedkedar wanaagsan, oo waxaa hoostiisa
ku hoyan doona haad cayn kasta ah, oo waxay degganaan
doonaan hooska laamihiisa. 24 Oo dhirta duurka ku taal oo
dhammuna waxay wada ogaan doonaan in aniga Rabbiga
ahu aan geedkii sare hoos u dejiyey, oo aan geedkii hoose
kor u qaaday, iyo inaan geedkii qoyanaa qallajiyey, oo aan
geedkii qallalnaa magooliyey. Aniga Rabbiga ah ayaa saas
ku hadlay oo saas sameeyey.

**18** Oo haddana Eraygii Rabbiga ayaa ii yimid isagoo
leh, 2 Maxaad ula jeeddaan markaad maahmaahdan
dalka reer binu Israa'iil ugu maahmaahdaan, idinkoo leh,
Aabbayaashu waxay cuneen canab dhanaan, oo carruurta
ilkahoodiina way saliilyoodeen? 3 Sayidka Rabbiga ahu
wuxuu leeyahay, Noloshaydaan ku dhaartaye inaydaan mar
dambe maahmaahdan dalka reer binu Israa'iil kaga dhex
maahmaahi doonin. 4 Bal eega, nafaha oo dhan anigaa iska
leh, oo sida nafta aabbuhu ay taydii u tahay ayaa tan wiilkuna
ay taydii u tahay, haddaba naftii dembaabtaa way dhiman
doontaa. 5 Laakiinse haddii nin xaq yahay oo uu waxa
xaqa ah oo qumman sameeyo, 6 oo uusan buuraha wax ku
cunin, ama uusan indhihiisa sanamyada reer binu Israa'iil
kor ugu taagin, ama uusan naagta deriskiisa nijaasayn,
ama uusan naag xayl qabta u dhowaan, 7 oo uusan cidna
dulmin, laakiinse uu kii wax ka deyntay rahaamaddiisii u

celiyey, oo uusan waxba xoog ku boobin, oo uu cuntadiisiina
mid gaajaysan siiyey, oo uu kii qaawanna dhar huwiyey,
8 ama uusan korsaar wax ku bixin, oo uusan ribo cidna
ka qaadan, oo uu yahay mid gacantiisa xumaanta dib uga
celiya, oo si caddaalad ah ugu garsooray nin iyo nin kale, 9
oo uu qaynuunnadayda ku socday, oo uu xukummadayda
u xajiyey si uu wax qumman u sameeyo, kaasu waa xaq,
oo hubaal wuu noolaan doonaa, ayaa Sayidka Rabbiga
ahu leeyahay. 10 Oo ninkaasu hadduu dhalo wiil tuug ah,
oo gacankudhiigle ah, amase wax waxyaalahaas la mid
ah sameeya, 11 oo uusan waxyaalaha waajibka ku ah
samayn, laakiinse uu buuraha wax ku cunay, oo uu naagtii
deriskiisana nijaaseeyey, 12 oo uu miskiinka iyo saboolka
baahan dulmay, oo uu xoog wax ku boobay, oo uusan cidna
rahaamad u celin, oo uu indhihiisana sanamyada kor ugu
taagay, oo uu wax karaahiya ah sameeyey, 13 oo uu korsaar
wax ku bixiyey, oo uu cid kale ribo ka qaatay, kaasu miyuu
noolaanayaa? Isagu noolaan maayo, waayo, waxyaalahaas
karaahiyada ah oo dhan ayuu sameeyey, hubaal wuu dhiman
doonaa, oo dhiiggiisuna isaguu dul saarnaan doonaa. 14
Haddaba bal eeg, kaasu hadduu dhalo wiil dembigii aabbihiis
sameeyey oo dhan arka, oo uu markaas cabsado, oo aan
waxaas oo kale samayn, 15 oo uusan buuraha wax ku cunin,
ama uusan indhihiisa sanamyada reer binu Israa'iil kor ugu
taagin, oo uusan naagta deriskiisa nijaasayn, 16 ama uusan
cidnaba dulmin, oo uusan rahaamadda qaadan, oo uusan
waxba xoog ku boobin, laakiinse uu cuntadiisa kii gaajaysan
siiyey, oo kii qaawanna dhar huwiyey, 17 oo uu gacantiisana
masaakiinta dib uga celiyey, oo uusan korsaar amase ribo
cidna ka qaadan, oo uu xukummadayda sameeyey, oo
uu qaynuunnadayda ku socday, kaasu xumaantii aabbihiis
sameeyey aawadeed uma dhiman doono, hubaalse wuu
noolaan doonaa. 18 Laakiinse aabbihiis xumaantiisuu ku
dhex dhiman doonaa, maxaa yeelay, isagu si nac weyn
ayuu wax u dulmay, oo walaalkiisna xoog buu wax kaga
boobay, oo dadkiisana wax aan wanaagsanayn buu ku dhex
sameeyey. 19 Laakiinse idinku waxaad tidhaahdaan, Wiilku
muxuu u qaadan waayaa xumaantii aabbihiis? Wiilku hadduu
sameeyo waxa xaqa ah oo qumman, oo uu qaynuunnadayda
oo dhan xajiyey, oo uu wada sameeyey, hubaal wuu noolaan
doonaa. 20 Nafta dembaabtaa way dhiman doontaa. Wiilku
ma uu qaadan doono xumaanta aabbaha, aabbuhuna ma uu
qaadan doono xumaanta wiilka. Ka xaqa ah xaqnimadiisaa
dul saarnaan doonta, oo ka sharka lehna sharnimadiisaa
dul saarnaan doonta. 21 Laakiinse ka sharka lihi hadduu
dembiyadiisii uu sameeyey oo dhan ka soo noqdo, oo
uu qaynuunnadayda oo dhan wada xajiyo, oo uu waxa
xaqa ah oo qumman sameeyo, hubaal kaasu wuu noolaan
doonaa, mana dhiman doono. 22 Oo xadgudubyadiisii uu
sameeyey oo dhan midna looma soo xusuusan doono.
Wuxuu ku noolaan doonaa xaqnimadiisii uu sameeyey. 23
Sayidka Rabbiga ahu wuxuu leeyahay, Anigu miyaan innaba
sharrowga dhimashadiisa ku farxaa? Sowse kama aan jecli
inuu jidkiisa ka soo noqdo oo uu noolaado? 24 Laakiinse ka
xaqa ahu hadduu xaqnimadiisa ka leexdo, oo uu xumaan
sameeyo, oo uu wada sameeyo waxyaalaha karaahiyada
ah ee uu sharrowgu sameeyo oo dhan, markaas miyuu sii
noolaan doonaa? Waxyaalihii xaqa ahaa ee uu sameeyey oo
dhan innaba lama soo xusuusan doono, oo wuxuu ku dhex
dhiman doonaa xadgudubkiisii uu xadgudbay, iyo dembigiisii
uu dembaabay. 25 Laakiinse idinku waxaad tidhaahdaan,
Sayidka jidkiisu ma qummana, haddaba reer binu Israa'iilow,
bal i maqla. Sow jidkaygu ma qummana? Sow jidadkiinnu
ma aha kuwa aan qummanaynu? 26 Marka ka xaqa ahu
uu xaqnimadiisa ka leexdo, oo uu xumaan sameeyo, oo
uu taas ku dhinto, wuxuu ku dhiman doonaa xumaantii uu
sameeyey. 27 Haddaba sharrowgu markuu sharnimadiisii uu
sameeyey ka soo noqdo, oo uu waxa xaqa ah ee qumman
sameeyo, markaasuu naftiisa badbaadin doonaa. 28 Isagu
wuu fiirsadaa, oo xadgudubyadiisii uu sameeyey oo dhan
wuu ka soo noqdaa, oo sidaas aawadeed hubaal wuu
noolaan doonaa, mana dhiman doono. 29 Laakiinse reer binu
Israa'iil waxay yidhaahdaan, Sayidka jidkiisu ma qummana.
Reer binu Israa'iilow, sow jidadkaygu ma qummana? Sow
jidadkiinnu ma aha kuwa aan qummanaynu? 30 Sidaas
daraaddeed Sayidka Rabbiga ahu wuxuu leeyahay, Reer
binu Israa'iilow, anigu midkiin kastaba waxaan u xukumi
doonaa siday jidadkiisu ahaayeen. Haddaba soo noqda,
oo xadgudubyadiinnii oo dhan ka soo noqda, si ayan
xumaantu halligaaddiinnii u noqon. 31 Xadgudubyadiinnii
aad xadgudubteen oo dhan iska xoora, oo waxaad yeelataan
qalbi cusub iyo ruux cusub, waayo, reer binu Israa'iilow,
bal maxaad u dhimanaysaan? 32 Waayo, Sayidka Rabbiga
ahu wuxuu leeyahay, Anigu innaba kii dhinta dhimashadiisa
kuma farxo, haddaba soo noqda oo noolaada.

19 Oo weliba waxaad u baroorataa amiirrada reer binu
Israa'iil, 2 oo waxaad tidhaahdaa, Hooyadaa maxay
ahayd? Gool bay ahayd! oo libaaxyay dhex jiiftay, oo
waxay dhasheedii ku dhex korisay libaaxyo yaryar. 3 Oo
dhasheedii midkood ayay korisay, oo wuxuu noqday libaax
aaran ah, oo wuxuu bartay sida ugaadha loo qabsado,
dad buuna cunay. 4 Quruumihii baa warkiisii maqlay, oo
waxaa isagii lagu qabtay godkoodii, oo dalkii Masar bay

qabatooyin ku keeneen. 5 Haddaba iyadu markay isagii
wax badan sugtay oo ay ka rajo beeshay waxay qaadatay
mid kale oo dhasheedii ah, oo waxay ka dhigtay libaax
aaran ah. 6 Oo isaguna libaaxyaduu dhex socday, oo wuxuu
noqday libaax aaran ah, oo wuxuu bartay sida ugaadha loo
qabsado, dad buuna cunay. 7 Qalcadahoodii buu yiqiin,
oo magaalooyinkoodiina cidla buu ka dhigay, oo dalkii iyo
wixii dhexdiisa ka buuxayba baabba' bay noqdeen, waana
codka cidiisa aawadiis. 8 Markaasaa quruumihii dhinac kasta
kaga keceen oo gobolladii oo dhan ka soo hujuumeen, oo
shabaggoodii bay ku kor kala bixiyeen, oo godkoodaa lagu
qabtay. 9 Oo intay qabatooyin ku qabteen ayay khafas ku
rideen, oo boqorkii Baabuloon bay u keeneen, oo waxay
ku rideen qalcado xoog badan si aan codkiisa mar dambe
buuraha reer binu Israa'iil looga maqlin. 10 Hooyadaa waxay
ahayd sidii geed canab ah oo dhiiggaaga ku dhex jira oo
biyo lagu ag beeray. Biyaha badan daraaddood ayay wax
midho badan iyo laamo miidhan ah u noqotay. 11 Oo waxay
lahayd laamo adadag oo ulo u ah kuwa xukunka hayay,
oo sarajooggeeduna wuxuu ka sii sara maray geedaha
laamahooda waaweyn, oo dhererkeedu wuxuu la muuqday
laameheeda badan aawadood. 12 Laakiinse iyadii cadhaa
lagu rujiyey, oo dhulkaa lagu soo xooray, oo dabayshii bari
ayaa midheheedii qallajisay, laameheedii adadkaana way
jajabeen oo engegeen, oo dab baa iyagii baabbi'iyey. 13 Oo
haddana waxaa iyadii lagu dhex beeray cidlada, taasoo ah
dhul engegan oo oommanaa. 14 Oo dab baa laameheedii ka
soo dhex baxay, oo midhaheedii dhammeeyey, oo sidaas
aawadeed iyadu ma leh laan adag oo ul wax lagu xukumo
noqon karta. Tanu waa baroorasho, oo baroorashay u noqon
doontaa.

**20** Oo sannaddii toddobaad, bisheedii shanaad,
maalinteedii tobnaad ayaa odayaashii reer binu Israa'iil
qaarkood u yimaadeen inay Rabbiga wax weyddiistaan, oo
hortayday fadhiisteen. 2 Haddana Eraygii Rabbiga ayaa
ii yimid isagoo leh, 3 Wiilka Aadamow, odayaasha reer
binu Israa'iil la hadal, oo waxaad ku tidhaahdaa, Sayidka
Rabbiga ahu wuxuu leeyahay, Ma waxaad u timaadeen
inaad wax i weyddiisataan? Sayidka Rabbiga ahu wuxuu
leeyahay, Noloshaydaan ku dhaartaye inaanan waxaad i
weyddiisataan maqlayn. 4 Wiilka Aadamow, ma doonaysaa
inaad iyaga xukuntid? Ma doonaysaa inaad iyaga xukuntid?
Bal iyaga waxyaalihii karaahiyada ahaa ee awowayaashood
ogeysii, 5 oo waxaad ku tidhaahdaa, Sayidka Rabbiga ahu
wuxuu leeyahay, Waagii aan reer binu Israa'iil doortay, oo
aan gacantayda kor ugu qaaday oo aan u dhaartay farcanka
reer Yacquub, oo aan iyaga dalkii Masar dhexdiisa isku
baray, oo aan ugu dhaartay anigoo ku leh, Anigu waxaan
ahay Rabbiga Ilaahiinna ah, 6 waagaas gacantaydaan kor
ugu qaaday oo aan iyaga u dhaartay inaan dalkii Masar ka
soo bixiyo oo aan soo geliyo dal aan iyaga u soo ilaaleeyey
oo caano iyo malab la barwaaqaysan, kaasoo ah ammaantii
dalalka oo dhan, 7 oo waxaan iyaga ku idhi, Ninkiin kastaaba
waxyaalaha karaahiyada ah ee indhihiisa ha iska xooro,
oo sanamyada Masar ha isku nijaasaynina. Aniga ayaa ah
Rabbiga Ilaahiinna ah. 8 Laakiinse way igu caasiyoobeen,
oo inay i maqlaan ayay diideen. Ninkoodna waxyaalihii
karaahiyada ahaa ee indhihiisa iskama xoorin, oo sanamyadii
Masarna kama ay tegin. Markaasaan idhi, Cadhadaydaan
ku kor shubi doonaa, si aan iyaga dalka Masar dhexdiisa
xanaaqayga ugu dhammaystiro. 9 Laakiinse magacayga
daraaddiis ayaan u shaqeeyey, si uusan ugu nijaasoobin
quruumihii ay dhex joogeen hortooda, waayo, iyagoo u
jeeda ayaan iyaga isbaray, markaan dalkii Masar ka soo
bixiyey. 10 Sidaas daraaddeed ayaan iyaga dalkii Masar ka
soo bixiyey oo cidlada keenay. 11 Oo waxaan iyaga siiyey
qaynuunnadaydii, xukummadaydiina waan tusay, kuwaasoo
ninkii sameeyaaba uu ku noolaanayo. 12 Oo weliba waxaan
siiyey sabtiyadayda inay ahaadaan calaamad aniga iyo
iyaga noo dhexaysa, si ay u ogaadaan inaan anigu ahay
Rabbiga iyaga quduus ka dhiga. 13 Laakiinse reer binu
Israa'iil way igu caasiyoobeen intii ay cidlada dhex joogeen.
Qaynuunnadaydii kuma ay socon, oo xukummadaydiina way
diideen, kuwaasoo ninkii sameeyaaba uu ku noolaanayo, oo
sabtiyadaydiina si weyn bay nijaas ka dhigeen. Markaasaan
idhi, Anigu waxaan korkooda ku shubi doonaa cadhadayda
inta ay cidlada dhex joogaan si aan u baabbi'iyo. 14
Laakiinse magacayga daraaddiis ayaan u shaqeeyey, si
uusan ugu nijaasoobin quruumihii ay dhex joogeen hortooda,
waayo, iyagoo u jeeda ayaan soo bixiyey. 15 Oo weliba
gacantaydaan kor ugu qaaday oo ugu dhaaray cidlada
dhexdeedii inaanan geeynayn dalkii aan siiyey oo caanaha
iyo malabka la barwaaqaysan oo ah ammaantii dalalka
oo dhan, 16 maxaa yeelay, xukummadaydii way diideen,
oo qaynuunnadaydiina kuma ay socon oo sabtiyadaydii
nijaas bay ka dhigeen, waayo, qalbigoodii wuxuu raacay
sanamyadoodii. 17 Habase ahaatee ishaydii way u tudhay si
aanan iyaga u baabbi'in, oo cidladiina kuma aanan dhex
dhammayn. 18 Oo waxaan carruurtoodii ku idhi intii ay cidladii
dhex joogeen, Qaynuunnada aabbayaashiin ha ku soconina,
oo xukummadoodana ha dhawrina, oo sanamyadoodana
ha isku nijaasaynina. 19 Aniga ayaa ah Rabbiga Ilaahiinna
ah. Qaynuunnadayda ku socda, oo xukummadayda xajiya

oo sameeya, 20 oo sabtiyadayda quduus ka dhiga, oo
iyana waxay ahaan doonaan calaamad aniga iyo idinka inoo
dhexaysa, si aad u ogaataan inaan anigu ahay Rabbiga
Ilaahiinna ah. 21 Laakiinse carruurtiina way igu caasiyoobeen,
oo qaynuunnadaydiina kuma ay socon, xukummadaydiina
inay sameeyaan ma xajin, kuwaasoo ninkii sameeyaaba uu
ku noolaanayo, oo sabtiyadaydiina nijaas bay ka dhigeen.
Markaasaan idhi, Cadhadaydaan ku kor shubi doonaa, si aan
xanaaqayga iyaga ugu dhammaystiro cidlada dhexdeeda.
22 Habase ahaatee gacantaydii waan ka soo celiyey, oo
magacayga daraaddiis baan u shaqeeyey, si uusan ugu
nijaasoobin quruumaha hortooda, waayo, iyagoo u jeeda
ayaan soo bixiyey. 23 Oo weliba gacantaydaan kor ugu
qaaday oo ugu dhaartay cidlada dhexdeedii inaan iyaga
quruumaha ku kala dhex eryi doono, oo aan waddammada
ku dhex firdhin doono, 24 maxaa yeelay, xukummadaydii
ma ay samayn, laakiinse qaynuunnadaydii way diideen, oo
sabtiyadaydiina nijaas bay ka dhigeen, oo indhahooduna
waxay raaceen sanamyadii awowayaashood. 25 Oo weliba
iyagaan siiyey qaynuunno aan wanaagsanayn, iyo xukummo
ayan ku noolaan karayn, 26 oo waxaan iyagii ku nijaaseeyey
hadiyadahoodii, maxaa yeelay, dab bay u dhex marsiiyeen
wixii maxal fura oo dhan, si aan iyaga cidla uga dhigo, si ay
u ogaadaan inaan anigu Rabbiga ahay. 27 Sidaas aawadeed
Wiilka Aadamow, waxaad la hadashaa reer binu Israa'iil,
oo waxaad ku tidhaahdaa, Sayidka Rabbiga ahu wuxuu
leeyahay, Weliba taasay awowayaashiin igu caayeen, wayna
igu xadgudbeen. 28 Waayo, markaan dalka keenay, kaasoo
aan gacanta ugu qaaday oo aan ugu dhaartay inaan iyaga
siin doono ayay arkeen kur kasta oo dheer iyo geed kasta
oo weyn, oo waxay halkaas ku bixiyeen allabaryadoodii,
oo qurbaankoodii iga cadhaysiiyey ayay halkaas ku soo
bixiyeen, oo weliba halkaasay caraftoodii udgoonayd ku
sameeyeen, oo halkaasay qurbaannadoodii cabniinka ku
daadiyeen. 29 Markaasaan ku idhi, Meesha sare oo aad
tagtaan maxay tahay? Ilaa maantadan la joogo waxaa
magaceeda la yidhaahdaa Baamaah. 30 Sidaas daraaddeed
waxaad reer binu Israa'iil ku tidhaahdaa, Sayidka Rabbiga
ahu wuxuu leeyahay, Ma waxaad isu nijaasaysaan sidii
awowayaashiin isu nijaaseeyeen oo kale? Oo ma waxaad ka
daba gashaan waxyaalahooda karaahiyada ah sida naag
ninkeed ka dhillowda oo kale? 31 Oo markaad hadiyadihiinna
bixisaan, oo aad wiilashiinna dabka dhex marsiisaan ma
waxaad isku nijaasaysaan sanamyadiinna oo dhan ilaa
maantadan la joogo? Haddaba reer binu Israa'iilow, miyaan
maqlaa waxaad i weyddiisanaysaan? Sayidka Rabbiga
ahu wuxuu leeyahay, Noloshaydaan ku dhaartaye, Maqli
maayo waxaad i weyddiisataan. 32 Oo waxa maankiinna
soo galaana innaba ma ay ahaan doonaan, waayo, waxaad
isku tidhaahdaan, Annagu waxaannu noqon doonnaa sida
quruumaha kale, iyo sida qolooyinka waddammada deggan
oo kale si aannu qoryo iyo dhagax ugu adeegno. 33
Sayidka Rabbiga ahu wuxuu leeyahay, Noloshaydaan ku
dhaartaye, hubaal boqor baan idiinku ahaan doonaa gacan
xoog badan iyo dhudhun fidsan iyo cadho la soo daadshay,
34 oo dadyowga waan idinka soo dhex bixin doonaa, oo
waddammadii aad ku kala dhex firidheen waxaan idinkaga
soo ururin doonaa gacan xoog badan iyo dhudhun fidsan
iyo cadho la soo daadshay. 35 Oo waxaan idiin keeni
doonaa cidlada dadyowga, oo halkaasaan fool ka fool
idinkula xaajoon doonaa. 36 Sidii aan awowayaashiin cidladii
dalka Masar ugula xaajooday oo kale ayaan idinkana idiinla
xaajoon doonaa, ayaa Sayidka Rabbiga ahu leeyahay. 37 Oo
waxaan idin soo marin doonaa usha hoosteeda, oo axdigaan
idinku xidhi doonaa. 38 Markaasaan idinka dhex sooci
doonaa caasiyiinta iyo kuwa igu xadgudba. Waxaan iyaga ka
soo bixin doonaa dalka ay qariib ahaanta u joogaan, laakiinse
dalka reer binu Israa'iil sooma ay geli doonaan, oo idinkuna
waxaad ogaan doontaan inaan anigu Rabbiga ahay. 39
Reer binu Israa'iilow, Sayidka Rabbiga ahu wuxuu leeyahay,
Haddeydnan i dhegaysanayn, taga, oo haddan iyo hadda
dabadeedba midkiin kastaaba sanamyadiisa ha u adeego,
laakiinse waa inaydaan magacayga quduuska ah mar dambe
nijaas kaga dhigin hadiyadihiinna iyo sanamyadiinna. 40
Waayo, Sayidka Rabbiga ahu wuxuu leeyahay, Reer binu
Israa'iil oo dhan kulligoodba dalka dhexdiisa ayay iigu
adeegi doonaan buurtayda quduuska ah taasoo ah buurta
dheer ee dalka reer binu Israa'iil, oo halkaasaan iyaga ku
aqbali doonaa. Oo halkaasaan qurbaannadiinna iyo inta ugu
horraysa ee hadiyadihiinna, iyo waxyaalihiinna quduuska
ah oo dhanba idinku weyddiisan doonaa. 41 Oo sida caraf
udgoon baan idiin aqbali doonaa markaan dadyowga idinka
soo dhex bixiyo oo aan waddammadii aad ku kala dhex
firidheen idinka soo ururiyo, oo dhexdiinnaan quduus ku
ahaan doonaa quruumaha hortooda. 42 Oo waxaad ogaan
doontaan inaan anigu Rabbiga ahay, markaan idin dhex
keeno dalka reer binu Israa'iil, kaasoo ah dalkii aan gacanta
ugu qaaday awowayaashiin oo aan ugu dhaartay inaan
iyaga siinayo. 43 Oo halkaasaad jidadkiinnii iyo falimihiinnii
aad isku nijaasayseenba ku soo xusuusan doontaan, oo
waxyaalihiinnii sharka ahaa ee aad samayseen oo dhan
ayaad isu nici doontaan. 44 Sayidka Rabbiga ahu wuxuu
leeyahay, Reer binu Israa'iilow, iyadoo aan ahayn sidii
jidadkiinnii sharka ahaa ay ahaayeen, amase sidii falimihiinnii

qudhunka ahaa ay ahaayeen, markaan magacayga aawadiis
idiinku shaqeeyo ayaad ogaan doontaan inaan anigu Rabbiga
ahay. **45** Oo haddana Eraygii Rabbiga ayaa ii yimid isagoo
leh, **46** Wiilka Aadamow, wejigaaga xagga koonfureed u sii
jeedi, oo hadal xagga koonfureed ka gees ah ku hadal, oo
waxaad wax ka sii sheegtaa kaynta duurka xagga koonfureed
ku taal; **47** oo waxaad kaynta koonfureed ku tidhaahdaa,
Rabbiga eraygiisa maqal: Sayidka Rabbiga ahu wuxuu
leeyahay, Bal ogow, dab baan kugu dhex shidi doonaa,
oo wuxuu wada baabbi'in doonaa geed kasta oo qoyan oo
dhexdaada ku yaal iyo geed kasta oo qallalanba. Ololka
ololayana lama demin doono, oo weji kasta oo tan iyo xagga
koonfureed iyo ilaa xagga woqooyi joogaana isaguu ku
guban doonaa. **48** Oo binu-aadmiga oo dhammuna waxay
wada arki doonaan in aniga Rabbiga ahu aan dabkaas
shiday, oo innaba lama demin doono. **49** Markaasaan idhi,
Sayidow, Rabbiyow, waxay iga yidhaahdaan, Sow isagu
masaalooyin kuma hadlin?

**21** Oo haddana Eraygii Rabbiga ayaa ii yimid isagoo leh,
**2** Wiilka Aadamow, wejigaaga xagga Yeruusaalem u sii
jeedi, oo hadal xagga meelaha quduuska ah ka gees ah
ku hadal, oo waxaad wax ka sii sheegtaa dalka reer binu
Israa'iil. **3** Oo waxaad dalka reer binu Israa'iil ku tidhaahdaa,
Rabbigu wuxuu leeyahay, Bal eeg, anigu col baan kugu
ahaye, oo intaan seeftayda galkeeda ka soo bixiyo ayaan kan
xaqa ah iyo sharrowgaba kaa baabbi'in doonaa. **4** Seeftaydu
intay galkeeda ka soo baxdo ayay wada baabbi'in doontaa
binu-aadmiga oo dhan tan iyo koonfur iyo ilaa woqooyi inta
ka dhex leh, maxaa yeelay, anigu waxaan markaas kaa
baabbi'in doonaa kan xaqa ah iyo sharrowgaba. **5** Oo binu-
aadmiga oo dhammuba waxay wada ogaan doonaan in
aniga Rabbiga ahu aan seeftaydii galkeedii ka soo bixiyey,
oo mar dambena dib uma ay noqon doonto. **6** Haddaba
Wiilka Aadamow, taah. Qalbijab iyo si qadhaadh hortooda
ugu taah. **7** Oo markay kugu yidhaahdaan, War maxaad la
taahaysaa? waxaad ugu jawaabtaa, Waxaan la taahayaa
warka soo socda aawadiis. Qalbi kastaaba waa dhalaali
doonaa, oo gacan kastaaba way taag gabi doontaa, oo
naf kastaaba way qalbi jabi doontaa, oo qof kasta jilbihiisu
sida biyo oo kale ayay u tabaryaraan doonaan. Sayidka
Rabbiga ahu wuxuu leeyahay, Bal eega, way soo socotaa,
wayna ahaanaysaa. **8** Oo haddana Eraygii Rabbiga ayaa
ii yimid isagoo leh, **9** Wiilka Aadamow, wax sii sheeg, oo
waxaad tidhaahdaa, Rabbigu wuxuu leeyahay, Waxaad
tidhaahdaa, Seef, seef baa la afeeyey, oo weliba waa la
safeeyey. **10** Waxaa loo afeeyey inay aad wax u layso, oo
waxaa loo safeeyey inay sida hillaac u dhalaasho. Haddaba
miyaynu rayraynaa? Usha wiilkaygu waxay quudhsataa
geed kasta. **11** Oo seefta waxaa loo dhiibay in la safeeyo si
wax loogu isticmaalo. Seefta waxaa loo soo afeeyey oo loo
soo safeeyey in gacanta loo geliyo kan wax laaya. **12** Wiilka
Aadamow, qayli oo barooro, waayo, waxay ku kor dhici
doontaa dadkayga, oo waxay ku kor dhici doontaa amiirrada
reer binu Israa'iil oo dhan. Iyaga iyo dadkaygaba seeftaa
loo dhiibay. Haddaba sidaas aawadeed bowdadaada u
dharbaax. **13** Sayidka Rabbiga ahu wuxuu leeyahay, Waxaa
jira tijaabin, oo maxaa jiri doona xataa hadday usha wax
quudhsata aanay mar dambe sii jiri doonin? **14** Haddaba
sidaas daraaddeed, Wiilka Aadamow, wax sii sheeg, oo
sacabbada isku dhufo. Seeftu saddex jeer ha dhacdo, taasoo
ah seefta wax lagu laayo, oo kan weyn laysa oo gelaysa
xataa qolladahooda. **15** Seefta ayaan irdahooda oo dhan ku
cabsiiyey, si uu qalbigoodu u dhalaalo, oo ay kufiddoodu
u sii badato. Sida hillaac baa loo dhalaashay oo waxaa
loo safeeyey waxlaynta aawadeed! **16** Dadka ururi, xagga
midigta u jeeso, dagaal isu diyaari, xagga bidixdana u jeeso,
wejigaaga dhinac kasta u jeedi. **17** Aniguna sacabbadaydaan
isku dhufan doonaa, waanan cadhabeeli doonaa. Aniga
Rabbiga ah ayaa saas ku hadlay. **18** Oo haddana Eraygii
Rabbiga ayaa ii yimid isagoo leh, **19** Weliba Wiilka Aadamow,
waxaad taswiir ku tilmaantaa laba jid oo ay seefta boqorka
Baabuloon ku iman karto, oo labadooduba waa inay isku dal
ka soo baxaan. Meel ku calaamadee, oo waxaad u yeeshaa
calaamad ku taal madaxa jidka magaalada soo gala. **20**
Waxaad taswiirtaa jid ay seeftu ugu iman karto Rabbaahda
reer Cammoon iyo Yeruusaalemta dhufayska leh oo dalka
Yahuudah ku dhex taal. **21** Waayo, boqorkii Baabuloon
wuxuu soo istaagay meesha jidadku ku kala leexdaan oo ah
labada jid madaxooda inuu faaliyo aawadeed. Fallaadhihiisii
wuu ku faaliyey, oo teraafiim ayuu la tashaday, oo beer
buu fiiriyey. **22** Midigtiisa waxaa yiil faalkii Yeruusaalem loo
faaliyey, inuu wax lagu jejebiyo dhisto, oo uu afka laynta
u furo, oo uu qaylo aad ugu dhawaaqo, oo uu wax lagu
jejebiyo irdaha ka hor samaysto, oo uu tuulmo tuulo, oo uu
qalcado dhisto. **23** Oo kuwa dhaarta ku dhaartay waxay
hortooda ku noqon doontaa sida faal aan waxtar lahayn oo
kale, laakiinse isagu xumaantuu soo xusuusan doonaa, si
iyaga lagu qabto aawadeed. **24** Sidaas daraaddeed Sayidka
Rabbiga ahu wuxuu leeyahay, Idinku xumaantiinnii waxaad
ka dhigteen in la soo xusuusto, oo saasaa xadgudubyadiinnii
loo soo bandhigay, oo sidaasaa dembiyadiinnu falimihiinna
oo dhan uga muuqdaan, maxaa yeelay, waa laydin soo
xusuustay, oo sidaas daraaddeed gacantaa laydinku qaban

doonaa. 25 Oo amiirka reer binu Israa'iil oo nijaasta iyo
sharka ah, oo wakhtigiisu hadda yimid marka la ciqaabayow,
26 Sayidka Rabbiga ahu wuxuu kugu leeyahay, Duubka iska
fur, oo taajka iska qaad. Xaalku sidiisii sii ahaan maayo. Kan
hooseeya sarraysii, oo kan sarreeya hoosaysii. 27 Anigu
waan afgembiyi, oo afgembiyi, oo afgembiyi doonaa iyada,
oo mar dambena siima ay ahaan doonto, ilaa uu yimaado kan
xaqa u lahu, oo isaga ayaan siin doonaa. 28 Haddaba Wiilka
Aadamow, wax sii sheeg, oo waxaad tidhaahdaa, Sayidka
Rabbiga ahu sidaasuu reer Cammoon iyo caydoodaba ka
leeyahay. Adigu waxaad tidhaahdaa, Seef, seef baa la soo
siibay, oo waxaa loo safeeyey waxlaynta aawadeed, inay
sida hillaac u dhalaasho oo ay wax baabbi'iso, 29 inta ay wax
aan waxba ahayn kuu arkayaan, oo ay wax been ah kugu
faaliyaan, si ay kuugu soo kor daadshaan kuwii la laayay oo
sharka ahaa, oo wakhtigoodii yimid markii la ciqaabo. 30
Galkeedii ha ku noqoto. Anigu waxaan kugu xukumi doonaa
meeshii lagugu abuuray iyo dalkii aad ku dhalatay. 31 Oo
waxaan kugu soo kor shubi doonaa dhirifkayga, oo dabkii
cadhadayda ayaan kugu soo afuufi doonaa, oo waxaan
gacanta kuugu ridi doonaa niman doqonna ah oo aad
waxbaabbi'inta u yaqaan. 32 Xaabo baad dabka u noqon
doontaa, oo dhiiggaaguna dalkuu dhex oolli doonaa, oo mar
dambe laguma soo xusuusan doono, waayo, aniga Rabbiga
ah ayaa saas ku hadlay.

**22** Oo haddana Eraygii Rabbiga ayaa ii yimid isagoo leh,
2 Haddaba Wiilka Aadamow, adigu ma doonaysaa
inaad xukunto, ma doonaysaa inaad magaalada dhiigga
qabta xukunto? Haddaba waa inaad iyada waxyaalaheeda
karaahiyada ah oo dhan ogeysiisid. 3 Oo waxaad tidhaahdaa,
Sayidka Rabbiga ahu wuxuu leeyahay, Waxaad tahay
magaalo dhexdeeda dhiig ku daadisa si uu wakhtigeedu
u yimaado, oo sanamyo iyada u daran samaysa inay
isku nijaasayso. 4 Waxaad ku eedowday dhiiggii aad
daadisay, oo waxaad ku nijaasowday sanamyadaadii aad
samaysatay, oo wakhtigaagiina waad ka yeeshay inuu soo
dhowaado, oo weliba cimrigaagiina wuu buuxsamay, oo
sidaas daraaddeed cay baan quruumaha kaaga dhigay,
oo majaajilo baan waddammada oo dhan kaaga dhigay. 5
Taada magaceedu ba'ay ee rabshadu ka buuxdaay, kuwa
kuu dhow iyo kuwa kaa foguba way kugu majaajiloon
doonaan. 6 Bal eeg, amiirrada reer binu Israa'iil ee ku
dhex jooga midkood kastaaba wuxuu sidii xooggiisu ahaa
ku talajiray inuu dhiig daadiyo. 7 Dhexdaaday aabbe iyo
hooyo ku fududaysteen, oo dhexdaaday shisheeyaha ku
dulmeen, oo dhexdaaday agoonta iyo carmalka ku dhibeen.
8 Waxyaalahaygii quduuska ahaa waad quudhsatay, oo
sabtiyadaydiina nijaas baad ka dhigtay. 9 Waxaa dhexdaada
jooga niman xanta qaada si ay dhiig u daadiyaan, oo
dhexdaada ayay buuraha wax ku cunaan, oo dhexdaada
ayay shar ku sameeyaan. 10 Dhexdaada ayay cawradii
aabbahood ku soo bannaan dhigaan, oo dhexdaada ayay
tan xaylka qabta ku ceebeeyaan. 11 Midba wuxuu karaahiyo
la sameeyaa naagtii deriskiisa, oo mid kalena wuxuu si
shar ah u nijaaseeyaa gabadha uu soddogga u yahay, oo
mid kalena wuxuu dhexdaada ku kufsadaa walaashiis oo
ah gabadhii aabbihiis. 12 Dhexdaada ayay laaluush ku
qaataan si ay dhiig u daadiyaan aawadeed, oo waxaad
qaadataa korsaar iyo ribo, oo si hunguri weyn iyo dulmi
ah ayaad uga faa'iidaysataa deriskaaga, oo aniga waad i
illowday, ayaa Sayidka Rabbiga ahu leeyahay. 13 Haddaba
bal eeg, anigu gacmahaygaan isugu dhuftaa faa'iidadaadii
aad daacadla'aanta ku heshay, iyo dhiiggii lagugu dhex
daadiyey. 14 Wakhtiga aan kula macaamiloon doono miyaa
qalbigaagu u adkaysan karaa, miyaase gacmahaagu xoog
u yeelan karaan? Aniga Rabbiga ah ayaa saas ku hadlay
oo saas samayn doona. 15 Oo quruumahaan kugu dhex
eryi doonaa, oo waddammadaan kugu dhex firdhin doonaa,
wasakhdaadana dhexdaada waan ka baabbi'in doonaa. 16
Oo waad isku nijaasoobi doontaa iyadoo ay quruumahu
indhaha ku hayaan, oo waxaad ogaan doontaa inaan anigu
Rabbiga ahay. 17 Oo haddana Eraygii Rabbiga ayaa ii yimid
isagoo leh, 18 Wiilka Aadamow, reer binu Israa'iil wasakh
bay ii noqdeen, oo kulligood waa naxaas iyo qasacad iyo bir
iyo laxaamad foornada ku dhex jira, oo xataa waa wasakhda
lacagta. 19 Sidaas daraaddeed Sayidka Rabbiga ahu wuxuu
leeyahay, Waxaan idinku soo ururin doonaa Yeruusaalem
gudaheeda, maxaa yeelay, kulligiin wasakh baad noqoteen.
20 Sida lacag, iyo naxaas, iyo bir, iyo laxaamad, iyo qasacad
loo soo ururiyo, oo foornada loogu dhex rido in dabka
lagu afuufo si loo dhalaaliyo aawadeed, sidaas oo kalaan
idinku soo wada ururin doonaa xanaaqayga iyo cadhadayda,
oo halkaasaan idinku ridi doonaa oo aan idinku dhalaalin
doonaa. 21 Hubaal waan idin soo ururin doonaa oo waxaan
idinku soo afuufi doonaa dabka cadhadayda, oo idinkuna
dhexdiisaad ku dhalaali doontaan. 22 Sida lacagta foornada
dhexdeeda loogu dhalaaliyo ayaad dhexdeeda ugu wada
dhalaali doontaan, oo waxaad ogaan doontaan in aniga
Rabbiga ahu aan cadhadaydii idinku kor shubay. 23 Oo
haddana Eraygii Rabbiga ayaa ii yimid isagoo leh, 24 Wiilka
Aadamow, waxaad Yeruusaalem ku tidhaahdaa, Waxaad
tahay dal aan la nadiifin oo aan maalinta dhirifka roob lagu
soo kor dayn. 25 Shirqool bay nebiyadeedu dhexdeeda ku

sameeyeen, sidii libaax ciyaya oo xoog wax ku qabsada.
Nafo dad ayay baabbi'iyeen, oo waxay iska qaataan khasnad
iyo waxyaalo qaali ah, oo waxay u yeeleen carmallo badan oo
dhexdeeda jooga. 26 Oo wadaaddadeediina sharcigaygii si
xun bay u dhaafeen, oo waxay nijaaseeyeen waxyaalahaygii
quduuska ahaa. Innaba ma ay kala duwin wixii quduuska
ahaa iyo wixii nijaasta ahaa, oo innaba dadka ma ay barin
inay kala gartaan wixii nadiifta ahaa iyo wixii aan nadiifta
ahayn, oo indhahoodana waxay ka qariyeen sabtiyadaydii,
oo anigana dhexdoodaa wax nijaas ah laygaga dhigay. 27
Amiirradeeda dhex joogaa waa sida yeey xoog wax ku
qabsata oo kale inay dhiig daadiyaan, iyo inay nafo dad
halligaan, si ay faa'iido daacadla'aan ugu helaan aawadeed.
28 Oo nebiyadeeduna waxay ku malaaseen dhoobo aan
nuurad lahayn, oo iyagoo aan Rabbigu la hadlin ayay
yidhaahdaan, Sayidka Rabbiga ah ayaa saas leh, illowse
waxay arkeen wax aan waxba ahayn, oo wax been ah bay
iyaga ugu faaliyeen. 29 Dadkii dalku waxay ku isticmaaleen
dulmi, oo wax bay dheceen, oo masaakiintii iyo saboolkii
baahnaa aad bay u dhibeen, oo xataa shisheeyihii si xun bay
u dulmeen. 30 Oo anigu waxaan dhexdooda ka doondoonay
nin heeraarka kor u dhisa oo hortayda ku soo istaaga meesha
dunsan dalka aawadiis, si aanan u baabbi'in, laakiinse midna
ma aan helin. 31 Sidaas daraaddeed dhirifkaygaan ku soo
shubay, oo dabkii cadhadayda ayaan ku baabbi'iyey, oo
jidkoodiina madaxoodaan kaga abaalmariyey, ayaa Sayidka
Rabbiga ahu leeyahay.

**23** Oo haddana Eraygii Rabbiga ayaa ii yimid isagoo
leh, 2 Wiilka Aadamow, waxaa jiray laba naagood oo
isku hooyo ah. 3 Oo dhillanimo bay Masar ku sameeyeen,
oo intii ay yaryaraayeen ayay dhilloobeen. Halkaasna
naasahoodii waa lagu tuujiyey, oo halkaasaa ibihii naasaha
ee bikradnimadooda lagu nabareeyey. 4 Oo labadooda
tan weyn waxaa la odhan jiray Aaholaah, oo walaasheed
magaceeduna wuxuu ahaa Aaholiibaah, oo kuwaygay
noqdeen, oo waxay dhaleen wiilal iyo gabdho. Haddaba
magacyadoodu waa sidan, Aaholaah waa Samaariya,
oo Aaholiibaahna waa Yeruusaalem. 5 Aaholaah waxay
dhillaysatay iyadoo taydii ah, oo waxay caashaqday kuwii
iyada jeclaa ee reer Ashuur oo deriska la ahaa, 6 kuwaas oo
dhar buluug ah xidhnaa, oo ahaa saraakiil iyo taliyayaal,
oo kulligood dhallinyaro suurad wacan ahaa, oo ahaa
fardooley fardo fuushan. 7 Oo iyadu kulligood bay ka
dhillaysatay, kuwaasoo kulligood ahaa raggii Ashuur ee ugu
wacanaa, oo ku alla kii ay caashaqday iyo sanamyadoodii
oo dhanba way isugu nijaasaysay. 8 Oo iyadu innaba kama
ay tegin dhillanimadeedii tan iyo markay Masar joogtay,
waayo, iyadoo yar ayay la seexdeen, oo ibihii naasaha ee
bikradnimadeeda way nabareeyeen, oo dhillanimadoodii
ayay iyada ku kor shubeen. 9 Oo sidaas daraaddeed waxaan
u gacangeliyey kuwii iyada jeclaan jiray ee reer Ashuur oo ay
caashaqday. 10 Kuwaasu cawradeedii bay soo bandhigeen,
oo waxay qaateen wiilasheedii iyo gabdhaheedii, iyadiina
seef bay ku dileen, oo magaceediina magac xun buu
dumarka dhexdiisa ku noqday, waayo, xukummo baa lagu
soo dejiyey. 11 Oo walaasheed Aaholiibaahna waxaas way
aragtay, laakiinse iyadu way kaga sii darnayd caashaqeedii,
oo xagga dhillanimadana way ka sii darnayd dhillanimada
walaasheed. 12 Waxay caashaqday kuwii reer Ashuur ee
deriska la ahaa, oo ahaa saraakiil iyo taliyayaal si qurux
badan u xidhan, oo ahaa fardooley fardo fuushan, oo
kulligood wada ahaa dhallinyaro suurad wacan. 13 Oo
anigu waxaan arkay inay nijaasowday, oo ay labadoodiiba
isku jid qaadeen. 14 Dhillanimadeediina way sii kordhisay,
waayo, waxay aragtay niman derbiga ku taswiiran, oo ahaa
taswiirihii reer Kaldayiin oo asal guduudan lagu taswiiray, 15
oo dhexda dhex-xidhyo ugu xidhan yihiin, oo madaxana
duubab la sibaaqeeyey ugu xidhan yihiin, oo kulligood la
wada moodo amiirro u eg reer Baabuloon dalkoodu Kalday
yahay. 16 Oo isla markii ay aragtay ayay caashaqday, oo
farriinqaadayaal dalkii Kalday bay ugu dirtay. 17 Oo reer
Baabuloon ayaa iyada sariirtii caashaqa ugu soo galay, oo
dhillanimadoodii iyaday ku nijaaseeyeen, oo iyana iyagay
la nijaasowday, oo nafsaddeediina iyagay ka go'day. 18
Sidaasay dhillanimadeedii u soo bandhigtay oo cawradeedii
daahay ka qaadday, markaasaa nafsaddaydii iyada uga
go'day sidii ay nafsaddaydu walaasheed uga go'day oo
kale. 19 Laakiinse waxay sii badisay dhillanimadeedii iyadoo
wakhtigii yaraanteeda soo xusuusanaysa markay dalkii
Masar ku dhillowday. 20 Waxay caashaqday dhillayadeeda
uu jiidhkoodu yahay sida jiidhka dameerrada, oo ay
shahwaddooduna tahay sida shahwadda fardaha oo kale.
21 Oo sidaas ayaad u soo xusuusatay sharkii yaraantaada
markay Masriyiintu ibihii naasahaaga ee yaraantaada
nabarayn jireen. 22 Sidaas daraaddeed Sayidka Rabbiga
ahu wuxuu leeyahay, Aaholiibaahay, bal ogow, kuwii ku
caashaqi jiray ayaan kugu soo kicin doonaa, kuwaasoo ay
naftaadu ka go'day, oo iyagaan dhinac kasta kaaga soo
dayn doonaa, 23 kuwaasoo ah reer Baabuloon, iyo reer
Kaldayiin oo dhan, iyo Feqood, iyo Shooca, iyo Qooca, iyo
reer Ashuur oo dhan oo iyaga la jira, oo kulligood ah rag
dhallinyaro ah oo suurad wacan oo ah saraakiil iyo taliyayaal,
iyo amiirro, iyo rag caan ah, oo kulligood fardo fuushan. 24

Oo waxay kugula soo duuli doonaan hub iyo gaadhifardood
iyo giraangiro iyo guuto dad, oo hareerahaaga oo dhan
ayay kaaga soo kici doonaan iyagoo wata gaashaan weyn,
iyo gaashaan yar, iyo koofiyad bir ah, oo waxaan iyaga u
dhiibi doonaa xukun, oo waxay kuu xukumi doonaan sida
ay xukummadoodu yihiin. 25 Oo waxaan kugu soo dayn
doonaa xanaaqayga masayrka ah, oo iyaguna cadho bay
kugula macaamiloon doonaan. Waxay kaa gooyn doonaan
sanka iyo dhegaha, oo intii kaa hadhaana seef bay ku
dhici doontaa. Waxayna kaxaysan doonaan wiilashaada iyo
gabdhahaagaba, oo intii kaa hadhana dab baa baabbi'in
doona. 26 Oo weliba dharkaaga way kaa wada muruxsan
doonaan, oo jowharadahaaga qurxoonna way kaa furan
doonaan. 27 Oo sidaasaan kaaga joojin doonaa sharkaagii
iyo dhillanimadaadii aad dalka Masar ka keentay, si aadan
indhahaaga kor ugu taagin, oo aadan Masar kol dambe soo
xusuusan. 28 Waayo, Sayidka Rabbiga ahu wuxuu leeyahay,
Bal eeg, waxaan kugu ridi doonaa gacantii kuwa aad neceb
tahay, iyo gacantii kuwii ay nafsaddaadu ka go'day. 29
Iyagu si nacayb badan ayay kugula macaamiloon doonaan,
oo wixii aad ku hawshootay oo dhanna way kaa qaadan
doonaan, oo waxay kaa tegi doonaan adigoo qaawan oo
aan dednayn. Oo cawradii dhillanimadaadana daahaa laga
qaadi doonaa, xataa sharkaaga iyo dhillanimadaadaba.
30 Waxyaalahaas waa lagugu samayn doonaa, maxaa
yeelay, dhillanimo baad quruumaha la daba gashay, oo
sanamyadooda waad ku nijaasowday. 31 Waxaad qaadday
jidkii walaashaa, oo sidaas daraaddeed koobkeedii gacantaan
kuu gelin doonaa. 32 Sayidka Rabbiga ahu wuxuu leeyahay,
Waxaad cabbi doontaa walaashaa koobkeedii dheeraa
oo weynaa, oo fudaydsasho baa laguugu qosli doonaa
oo waa lagu quudhsan doonaa, waayo, wuu buuxaa.
33 Aad baad u sakhraami doontaa oo murug baa kaa
buuxsami doonta, oo waxaad ku cabbi doontaa koobkii
yaabka iyo baabba'da, kaasoo ah koobkii walaashaa
Samaariya. 34 Waad cabbi doontaa, oo weliba waad
heenheensan doontaa, oo burburkiisana waad ruugi doontaa,
oo naasahaagaad jiidi doontaa, waayo, Sayidka Rabbiga
ahu wuxuu leeyahay, Aniga ayaa saas ku hadlay. 35 Sidaas
daraaddeed Sayidka Rabbiga ahu wuxuu leeyahay, Waad i
illowday oo dhabarkaaga gadaashiisaad igu xoortay, sidaas
daraaddeed waa inaad sharkaaga iyo dhillanimadaadaba u
xambaarataa. 36 Oo weliba Rabbigu wuxuu kaloo igu yidhi,
Wiilka Aadamow, Aaholaah iyo Aaholiibaah miyaad xukumi
doontaa? Bal waxyaalahooda karaahiyada ah u sheeg. 37
Waayo, way sinaysteen, oo dhiig baa gacmahooda ku jira,
oo sanamyadoodana way ka sinaysteen, oo wiilashoodii ay ii
dhaleenna dab bay u dhex marsiiyeen si ay u baabba'aan
aawadeed. 38 Oo weliba saasoo kalay igu sameeyeen. Iyagu
isku maalin ayay meeshaydii quduuska ahayd nijaaseeyeen,
oo sabtiyadaydiina wax nijaas ah bay ka dhigeen. 39 Waayo,
markay carruurtoodii sanamyadooda u qaleen ayay isla
maalintaasba meeshaydii quduuska ahayd u soo galeen inay
nijaaseeyaan, oo bal eeg, waxaas ayay gurigayga dhexdiisa
ku sameeyeen. 40 Oo weliba rag baad meel fog uga cid
dirsatay, oo waxaa loo diray wargeeye, oo bal eeg, iyana way
yimaadeen, oo iyaga aawadood ayaad isu soo maydhay, oo
u indhakuushatay, oo wax baad isugu sharraxday, 41 oo
waxaad ku fadhiisatay sariir haybad badan oo miis horteeda
lagu soo diyaarshay, kaasoo aad fooxaygii iyo saliiddaydii
saartay. 42 Oo waxaa iyada la jiray codka dadka faraha
badan, oo raaxaysan, oo dadkii faraha badnaana waxaa la
yimid sakhraamiin cidlada laga keenay, oo waxay gacmaha
u geliyeen dugaagado, oo madaxana taaj qurux badan bay
u saareen. 43 Markaasaan tii sinada ku gabowday ka idhi,
Miyey haddana ka sinaysan doonaan, oo iyaduse miyey
iyaga ka dhillaysan doontaa? 44 Laakiinse iyadii waxay ugu
galeen sidii naag dhillo ah loogu galo oo kale, oo sidaasay
ugu galeen naagihii sharka ahaa oo ahaa Aaholaah iyo
Aaholiibaah. 45 Oo ragga xaqa ahu waxay iyaga u xukumi
doonaan sida dhillooyin iyo naago dhiig galay loo xukumo oo
kale, maxaa yeelay, iyagu waa dhillooyin, oo gacmahoodana
dhiig baa ku yaal. 46 Waayo, Sayidka Rabbiga ahu wuxuu
leeyahay, Guuto baan iyaga ku soo kicin doonaa, oo cabsi
iyo dhac baan u gacangelin doonaa. 47 Oo guutadaasu
iyagay dhagxin doontaa oo seefaf ku kala jarjari doontaa, oo
wiilashooda iyo gabdhahoodaba way wada layn doonaan, oo
guryahoodana dab bay ku gubi doonaan. 48 Oo sidaasaan
shar dalka uga joojin doonaa, si naagaha oo dhan loo baro
inaanay mar dambe sidii sharkiinnii oo kale u falin. 49 Oo
sharkiinnii waa laydinka abaalmarin doonaa, oo dembiyadii
sanamyadiinna ayaad xambaaran doontaan, oo markaasaad
ogaan doontaan inaan anigu ahay Sayidka Rabbiga ah.

24 Oo haddana Eraygii Rabbiga ayaa ii yimid sannaddii
sagaalaad, bisheedii tobnaad, maalinteedii tobnaad,
isagoo leh, 2 Wiilka Aadamow, maalintan, xataa isla
maantadan qudheeda magaceeda qor, waayo, boqorkii
Baabuloon isla maantadan qudheeda ayuu Yeruusaalem
ku soo dhowaaday. 3 Oo reerka caasiyoobay waxaad
kula hadashaa masaal, oo waxaad ku tidhaahdaa, Sayidka
Rabbiga ahu wuxuu leeyahay, Digsiga dabka saara, saara
oo biyo ku shuba. 4 Oo waxaad ku gurtaan cadcadka, xataa
cadcadka wanwanaagsan oo dhan, oo ah bowdada iyo

garabka, oo waxaad ka buuxisaan lafaha ugu wacan. **5**
Waxaad soo wadataan adhiga jarkiisa, oo waxaad hoostiisa
ku gurtaan lafaha, oo si wanaagsan u kariya, oo lafihiisana
ku dhex kariya. **6** Sidaas daraaddeed Sayidka Rabbiga
ahu wuxuu leeyahay, Waxaa iska hoogtay magaalada
dhiigga qabta, taasoo ah digsiga miridhkiisu ku jiro, oo
aan miridhkiisu ka bixin! Cadcad u soo bixiya, iyadoo
aan saami lagu bixin. **7** Waayo, dhiiggeedii dhexdeeduu
yaal. Waxay kor saartay dhagax diiran, oo dhulkana kuma
ay daadin si ay ciid ugu daboosho aawadeed. **8** Inay
cadho ugu soo kacdo oo ay ka aarsato ayaan dhiiggeedii
dhagax diiran dul saaray si uusan u daboolmin. **9** Sidaas
daraaddeed Sayidka Rabbiga ahu wuxuu leeyahay, Waxaa
iska hoogtay magaalada dhiigga qabta! Aniguna tuulmada
waan weynayn doonaa. **10** Qoryo ku sii gur, oo dabka sii
shid, oo hilibka aad u kari, oo maraqana xawaash ku shub,
oo lafuhuna ha gubteen. **11** Markaas digsiga oo madhan
dhuxusha shidan saar si uu u kululaado, oo ay naxaastiisu
u gubato, oo ay wasakhdiisu gudihiisa ugu dhalaasho oo
uu miridhkiisuna u baabba'o. **12** Iyadu si aan waxba tarayn
ayay isu daalisay, oo miridhkeeda badanna iyada kama uu
baxo, oo miridhkeeda dabka kagama baxo. **13** Wasakhdaada
shar baa ku jira, maxaa yeelay, waan ku nadiifiyey laakiinse
waad nadiifsanaan weyday, haddaba innaba wasakhdaada
kama aad nadiifsami doontid jeeraan cadhadayda kugu
dhammaystiro. **14** Aniga Rabbiga ah ayaa saas ku hadlay.
Saasay noqon doontaa, oo taasaan samayn doonaa. Innaba
dib ugama aan noqon doono, mana tudhi doono, oo innaba
kama aan soo noqon doono. Siday jidadkaagu ahaayeen
iyo siday falimahaagu ahaayeen ayay kuu xukumi doonaan
ayaa Sayidka Rabbiga ahu leeyahay. **15** Oo haddana Eraygii
Rabbiga ayaa ii yimid isagoo leh, **16** Wiilka Aadamow,
bal ogow, waxaan darbad qudha kaaga qaadayaa tii ay
indhahaagu jecel yihiin, laakiinse ha u barooran, hana u
ooyin, oo ilmadaaduna innaba yaanay u daadan. **17** Taah,
laakiin si aamusan u taah, oo baroorasho kuwii dhintay loo
baroorto ha u barooran. Duubkaaga madaxa ku duubo, oo
kabaha gasho, oo bushimahaagana ha daboolin, oo kibista
dadkana innaba ha cunin. **18** Markaasaan aroortii dadkii la
hadlay, makhribkiina naagtaydii way dhimatay, oo aniguna
sidii laygu amray ayaan subaxdii yeelay. **19** Oo markaasaa
dadkii waxay igu yidhaahdeen, War maad noo sheegtid
waxan aad samaynaysid ulajeeddadooda? **20** Markaasaan
ugu jawaabay, Eraygii Rabbiga ayaa ii yimid isagoo leh, **21**
Reer binu Israa'iil la hadal, oo waxaad ku tidhaahdaa, Sayidka
Rabbiga ahu wuxuu leeyahay, Bal ogaada, meeshayda
quduuska ah ayaan nijaasayn doonaa, taasoo ah faankii
xooggiinna iyo waxa ay indhihiinnu jecel yihiin, iyo waxa
ay naftiinnu u naxdo; oo wiilashiinna iyo gabdhihiinna aad
ka tagteenna seef bay ku le'an doonaan. **22** Oo idinkuna
sidaan yeelay oo kale ayaad yeeli doontaan. Bushimihiinna
ma aad dabooli doontaan, oo kibista dadkana ma aad cuni
doontaan. **23** Oo duubabkiinnu madaxay idiinku duubnaan
doonaan, oo kabihiinnuna cagahay idiinku jiri doonaan.
Ma aad barooran doontaan, mana aad ooyi doontaan,
laakiinse xumaatooyinkiinna baad la macaluuli doontaan, oo
midkiinba kan kaluu ku musannaabi doonaa. **24** Sidaasuu
Yexesqeel calaamad idiinku ahaan doonaa, oo wax alla wixii
uu sameeyey ayaad idinkuna samayn doontaan. Oo markay
waxaasu dhacaan ayaad ogaan doontaan inaan anigu ahay
Sayidka Rabbiga ah. **25** Oo weliba Wiilka Aadamow, maalinta
aan iyaga ka qaado xooggooda, iyo farxadda sharaftooda,
iyo waxa ay indhahoodu jecel yihiin, iyo waxa uu qalbigoodu
raaco, iyo wiilashooda iyo gabdhahoodaba, soo noqon
maayo **26** in kii soo baxsaday uu maalintaas kuu iman doono
inuu dhegahaaga wixii dhacay oo dhan kugu maqashiiyo?
**27** Oo maalintaas qudheeda ayaa afkaagu kii soo baxsaday
u furmi doonaa, oo waad hadli doontaa, oo mar dambena
ma aad carrab la'aan doontid. Sidaasaad calaamad u noqon
doontaa, oo iyaguna waxay ogaan doonaan inaan anigu
Rabbiga ahay.

**25** Oo haddana Eraygii Rabbiga ayaa ii yimid isagoo
leh, **2** Wiilka Aadamow, wejigaaga reer Cammoon
u sii jeedi oo iyaga wax ka sii sheeg, **3** oo waxaad reer
Cammoon ku tidhaahdaa, Sayidka Rabbiga ah eraygiisa
maqla, Sayidka Rabbiga ahu wuxuu leeyahay, Waxaad
Ahaa ku tidhaahdeen meeshayda quduuska ah markii la
nijaaseeyey, iyo markuu dalka reer binu Israa'iil cidlada
noqday, iyo markay dadka Yahuudah maxaabiisnimo u
bexeen, **4** sidaas daraaddeed bal ogow, hanti ahaan ayaan
dadka bari kuu siin doonaa, oo iyana xerooyinkooda bay kaa
dhex samaysan doonaan, oo hooygoodana dhexdaaday
ka samaysan doonaan. Midhahaaga way cuni doonaan,
caanahaagana way dhami doonaan. **5** Oo Rabbaahna
waxaan ka dhigi doonaa gole geel, meesha reer Cammoonna
waxaan ka dhigi doonaa xeryo adhi, oo markaasaad ogaan
doontaan inaan anigu Rabbiga ahay. **6** Waayo, Sayidka
Rabbiga ahu wuxuu leeyahay, Waad sacbisay, waanad
rablaysay, oo qalbigaagaad ku rayraysay adigoo aad iyo
aad dalka reer binu Israa'iil u quudhsanaya, **7** oo sidaas
daraaddeed bal ogow, gacantaydaan kugu soo dul fidiyey, oo
quruumaha ayaan booli ahaan kuu siin doonaa, oo dadyowga
dhexdooda waan kaa gooyn doonaa, oo waxaan kaa dhigi

doonaa inaad waddammada oo dhan ka halligantid, waanan
ku wada baabbi'in doonaa, oo waxaad ogaan doontaa inaan
Rabbiga ahay. 8 Sayidka Rabbiga ahu wuxuu leeyahay,
Moo'aab iyo Seciir waxay leeyihiin, Dadka dalka Yahuudah
quruumaha oo dhan bay la mid yihiin. 9 Sidaas daraaddeed
bal ogaada, anigu dalka Moo'aab dhinac baan ka faruuri
doonaa xagga magaalooyinkiisa, waana magaalooyinka
soohdintiisa ku yaal, kuwaas oo ah dalka ammaantiisa, oo
ah Beytyeshimood, iyo Bacal Mecoon, iyo Qiryatayim, 10
oo waxaan u sii dayn doonaa dadka reer bari inay reer
Cammoon ku kacaan, oo hanti ahaan baan iyaga u siin
doonaa si aan reer Cammoon mar dambe quruumaha
dhexdooda loogu soo xusuusan, 11 oo anigu xukun baan
reer Moo'aab ku soo dejin doonaa, oo markaasay ogaan
doonaan inaan anigu Rabbiga ahay. 12 Sayidka Rabbiga ahu
wuxuu leeyahay, Reer Edom aarsasho buu dadka Yahuudah
kula macaamilooday, oo si weyn ayuu u xumeeyey, oo
iyaga wuu ka aar goostay, 13 sidaas daraaddeed Sayidka
Rabbiga ahu wuxuu leeyahay, Gacantaydaan dalka Edom
ku dul fidin doonaa, oo dad iyo duunyoba waan ka baabbi'in
doonaa, oo cidla baan ka dhigi doonaa tan iyo Teman,
oo tan iyo Dedaan seef baa lagu le'an doonaa. 14 Oo
waxaan aarsashadayda dul saari doonaa reer Edom, oo
gacanta dadkayga reer binu Israa'iil ayaan kaga aarsan
doonaa, iyaguna reer Edom way ku samayn doonaan sida ay
cadhadaydu tahay iyo sida uu xanaaqaygu yahay, oo waxay
ogaan doonaan aarsashadayda, ayaa Sayidka Rabbiga
ahu leeyahay. 15 Sayidka Rabbiga ahu wuxuu leeyahay,
Reer Falastiin aarsashay kula macaamiloodeen oo iyagoo
qalbiga ka quudhsanaya ayay ka aarsadeen si ay cadownimo
weligeed ah ugu baabbi'iyaan, 16 sidaas daraaddeed Sayidka
Rabbiga ahu wuxuu leeyahay, Bal eeg, gacantaydaan reer
Falastiin ku dul fidin doonaa, oo reer Kereetiimna waan
gooyn doonaa, oo kuwa badda xeebteeda ku hadhayna
waan baabbi'in doonaa. 17 Oo waxaan dushooda ku soo
dejin doonaa aarsasho weyn anigoo xanaaq weyn ku
canaananaya, oo markaan aarsashadayda dul saaro waxay
ogaan doonaan inaan anigu Rabbiga ahay.

**26** Oo haddana sannaddii kow iyo tobnaad, bisha
maalinteedii kowaad Eraygii Rabbiga ayaa ii yimid
isagoo leh, 2 Wiilka Aadamow, Reer Turos wuxuu
Yeruusaalem ku yidhi, Ahaa, tii dadyowgii iriddiisa ahaan
jirtay way jabtay, oo anigay ii soo jeedday, oo haddana waan
buuxsanaan doonaa, waayo, iyadu haatan waa cidla. 3
Sidaas daraaddeed Sayidka Rabbiga ahu wuxuu leeyahay,
Reer Turosow, bal eeg, anigu col baan kugu ahaye, oo
waxaan ka dhigi doonaa inay quruumo badanu kuugu
soo kacaan siday baddu hirarkeeda u soo kiciso oo kale.
4 Oo iyagu derbiyada Turos way baabbi'in doonaan, oo
munaaradaheedana way dumin doonaan, oo ciiddeedana
waan ka xoqi doonaa, oo dhagax diiran oo kale baan ka
dhigi doonaa. 5 Oo waxay noqon doontaa meel shabagyo
lagu wadho oo badda dhexdeeda ku taal, waayo, Sayidka
Rabbiga ahu wuxuu leeyahay, Aniga ayaa saas ku hadlay, oo
booli bay quruumaha u noqon doontaa. 6 Oo gabdhaheeda
berrinka joogana seef baa lagu wada layn doonaa; oo
waxay ogaan doonaan inaan anigu Rabbiga ahay. 7 Waayo,
Sayidka Rabbiga ahu wuxuu leeyahay, Bal ogaada, waxaan
Turos ku soo kicin doonaa boqorka Baabuloon oo ah
Nebukadresar boqorkii boqorrada, oo xagga woqooyi buu ka
iman doonaa isagoo wata fardo, iyo gaadhifardoodyo, iyo
rag fardooley ah, iyo guuto ciidan ah, iyo dad faro badan. 8
Oo isagu gabdhahaaga berrinka jooga seef buu ku wada
layn doonaa, oo qalcado buu kuu samaysan doonaa, oo
tuulmo buu kuu tuulan doonaa, oo gaashaan weyn ayuu
kor kuugu qaadan doonaa. 9 Wuxuu derbiyadaada ku tumi
doonaa wax lagu jejebiyo, oo munaaradahaagana wuxuu ku
dumin doonaa faasaskiisa. 10 Oo fardihiisa badan aawadood
ayaa boodhkoodu ku qarin doonaa, oo derbiyadaaduna
waxay la gariiri doonaan ragga fardooleyda buuqooda, iyo
giraangiraha iyo gaadhifardoodyada gurdankooda, markuu
irdahaaga u soo galo sida rag u soo galo magaalo dhinac
laga faruuray oo kale. 11 Oo qoobabka fardihiisa ayuu
jidadkaaga oo dhan kula tuman doonaa, oo dadkaagana seef
buu ku wada layn doonaa, oo tiirarkaaga adadaguna dhulkay
ku soo dhici doonaan. 12 Maalkaaga way dhici doonaan, oo
booli ahaan bay baayacmushtarkaaga u qaadan doonaan,
oo derbiyadaadana way dumin doonaan, oo daarahaaga
qurqurxoonna way burburin doonaan, oo dhagxantaada iyo
alwaaxdaada iyo boodhkaagaba biyahay ku dhex daadin
doonaan. 13 Oo waxaan joojin doonaa qaylada heesahaaga,
oo kataaradahaaga sanqadhoodana mar dambe lama maqli
doono. 14 Waxaanan kaa dhigi doonaa sida dhagax diiran oo
kale, oo waxaad noqon doontaa meel shabagyada lagu dul
wadho, oo mar dambena dib laguuma dhisi doono, waayo,
Sayidka Rabbiga ahu wuxuu leeyahay, Aniga Ilaaha ah ayaa
saas ku hadlay. 15 Sayidka Rabbiga ahu wuxuu reer Turos
ku leeyahay, Markii kuwa dhaawaca ahu cabaadaan oo dad
badan dhexdaada lagu laayo, sow jasiiraduhu sanqadha
dhiciddaada kama gariiri doonaan? 16 Oo markaasay
amiirrada badda oo dhammu carshiyadooda ka soo degi
doonaan, oo waxay iska bixin doonaan khamiisyadooda,
oo dharkooda daabaca lehna way iska saari doonaan, oo

intay gariir xidhaan ayay dhulka fadhiisan doonaan, oo
daqiiqad kastana way iska gariiri doonaan, wayna kula yaabi
doonaan. 17 Oo baroor ayay kor kuugu qaylin doonaan,
oo waxay kugu odhan doonaan, Magaaladii caanka ahayd,
oo dadka badaha maraa ay degganaayeen, oo badaha ku
xoog badnayd iyada iyo dadkeeda degganuba, oo kuwa
ku hareeraysan oo dhan ka cabsiin jirtayay, sidee baad u
ba'day! 18 Haddaba maalinta dhiciddaada gasiiraduhu way
wada gariiri doonaan, hubaal gasiiradaha badda ku dhex
yaallaa bixitinkaaga aawadiis ayay la argaggixi doonaan. 19
Waayo, Sayidka Rabbiga ahu wuxuu leeyahay, Markaan
magaalo cidla ah kaa dhigo sida magaalooyinka aan ciduna
degganayn oo kale iyo markaan moolka korkaaga ku soo
daayo, oo ay biyo badanu ku daboolaan, 20 markaasaan kula
dejin doonaa kuwa yamayska ku dhaadhaca, kuwaasoo ah
dadkii waayihii hore jiri jiray, oo waxaan dhulka meesha ugu
hoosaysa, oo ah meelo waa hore cidloobay, kula fadhiisin
doonaa kuwa yamayska ku dhaadhaca, si aan ciduna kuu
degin, oo dalka kuwa noolna waxaan dhex dhigi doonaa
sharaf. 21 Waxaan kaa dhigi doonaa cabsi, oo innaba mar
dambe siima aad jiri doontid. Sayidka Rabbiga ahu wuxuu
leeyahay, In kastoo lagu doondoono kol dambe laguma heli
doono.

**27** Oo haddana Eraygii Rabbiga ayaa ii yimid isagoo leh,
2 Wiilka Aadamow, haddana Turos aawadeed baroor
kor ugu qayli, 3 oo waxaad Turos ku tidhaahdaa, Taada
badda kadinkeeda ku taal, oo ah meesha ay gasiirado badan
dadkoodu ka baayacmushtaraanay, Sayidka Rabbiga ahu
wuxuu leeyahay, Turosay, waxaad istidhi, Anigu waxaan
leeyahay qurux kaamil ah. 4 Soohdimahaagu waxay ku
yaallaan badda dhexdeeda, oo kuwii ku dhisayna quruxdaadii
way kaamileen. 5 Alwaaxda doonniyahaaga oo dhan
waxay ka sameeyeen dhirta berooshka ah ee Seniir, oo
Lubnaan waxay ka soo goosteen geedo kedar ah si ay
daqal kaaga dhigaan. 6 Waxay seebab kaaga sameeyeen
geedihii alloonka ee Baashaan, oo kursiyadaadiina waxay
ka sameeyeen alwaax gasiiradaha Kitiim laga keenay oo
foolmaroodi lagu sharxay. 7 Oo waxaa shiraaq kuu ahaa maro
wanaagsan oo daabac leh oo Masar laga keenay, si ay taasu
calaamad kuugu ahaato, oo waxaa kugu dednaa buluug iyo
guduud gasiiradaha Eliishaah laga keenay. 8 Turosay, kuwii
sixiimadahaagii seebiyey waxay ahaayeen dadka Siidoon
iyo Arwaad deggan, oo kuwii xigmadda lahaa ee ku dhex
joogayna waxay ahaayeen doonniyawadayaashaadii. 9
Odayaashii Gebal iyo kuweedii xigmadda lahaa ee ku dhex
joogay ayaa kuwa dillaacyada awda kuu ahaayeen, oo badda
doonniyaheedii oo dhan iyo baxriyadoodii oo dhammuba
way ku dhex joogeen si ay kuula baayacmushtaraan. 10
Reer Faaris, iyo reer Luud, iyo reer Fuud ayaa ciidankaagii
ku jiray, oo waxay kuu ahaayeen dagaalyahankaagii, oo
dhexdaaday gaashaanka iyo koofiyadda dagaalka sudheen,
oo waxay soo bandhigeen quruxdaadii. 11 Oo derbiyadaadii
kugu wareegsanaana waxaa dul joogay raggii reer Arwad
iyo ciidankaagii, oo munaaradahaagiina waxaa ku jiray raggii
reer Gammaadiim. Iyana gaashaammadooday derbiyadaadii
kugu wareegsanaa sudheen, oo quruxdaadiina kaamil bay ka
dhigeen. 12 Tarshiish waxay ahayd tii kula baayacmushtari
jirtay hodantinimadaadii badnayd ee cayn kasta ahayd
aawadeed, oo waxay alaabtaadii kaga baayacmushtari jirtay
lacag, iyo bir, iyo qasacad, iyo alxan. 13 Oo reer Yaawaan,
iyo reer Tubal, iyo reer Meshegna way kula baayacmushtari
jireen, oo waxay alaabtaadii kaga baayacmushtari jireen dad
noolnool iyo weelal naxaas ah. 14 Oo kuwii reer Togarmaahna
waxay alaabtaadii kaga baayacmushtari jireen fardo iyo
fardo la fuulo iyo baqlo. 15 Dadkii reer Dedaanna way
kula baayacmushtari jireen, oo gasiirado badan ayaa kuu
ahaan jiray meelahaad ku baayacmushtartid, oo waxay kuu
keeni jireen foolmaroodi iyo qori haabniim ah. 16 Suuriyana
way kula baayacmushtari jirtay, maxaa yeelay, sanco faro
badan baad samayn jirtay, oo waxay alaabtaada kaga
baayacmushtari jireen dhagaxyo sumurud la yidhaahdo,
iyo guduud, iyo daabac, iyo dhar wanaagsan, iyo shacaab
iyo dhagax agate la yidhaahdo. 17 Dalka Yahuudah iyo
dalka Israa'iilna way kula baayacmushtari jireen, oo waxay
alaabtaada kaga baayacmushtari jireen sarreenkii Minniid,
iyo fannag macaan, iyo malab, iyo saliid, iyo beeyo. 18
Dimishaqna way kula baayacmushtari jirtay sancadaadii
faraha badnayd aawadeed, iyo hodantinimadaadii badnayd
ee cayn kasta ahayd oo dhan, oo waxay ka dhaafsan
jirtay khamrigii Xelboon iyo dhogor cad. 19 Wedaan iyo
Yaawaan waxay alaabtaada kaga baayacmushtareen dun,
oo alaabtaadana waxaa ka mid ahaa bir dhalaalaysa iyo
kasiya iyo kalamus. 20 Dedaan waxay kaga baayacmushtari
jirtay dharka qaaliga ah ee fardaha lagu saldhaysto. 21
Carabiya iyo amiirradii reer Qedaar oo dhammu waxay
kuu soo iib geeysan jireen baraar, iyo wanan iyo orgi: oo
waxaasay kaaga baayacmushtari jireen. 22 Oo reer Shebaa
iyo reer Racmaahna way kula baayacmushtari jireen, oo
waxay alaabtaadii kaga baayacmushtari jireen xawaashka
ugu fiican, iyo dhagxan kasta oo qaali ah, iyo dahab. 23
Oo waxaa kaloo kula baayacmushtari jiray Xaaraan, iyo
Kanneeh, iyo Ceeden, iyo baayacmushtariyaashii Shebaa,
iyo Ashuur, iyo Kilmad oo dhan. 24 Kuwaasu waxay ahaan
jireen baayacmushtariyaasha kaa iibin jiray alaab door ah

oo cayn kasta ah oo ahaa dhar buluug ah, iyo daabac, iyo
sanaaduuq uu dhar qaali ahu ka buuxo oo ay xadhko ku
xidhxidhan yihiin oo alwaax kedar ah laga sameeyey. 25
Doonniyaha Tarshiish ayaa shixnaddaada qaadi jiray, oo
adigu waad buuxsantay, oo badda dhexdeeda ayaad aad
ugu sharaf badnayd. 26 Kuwii seebab kuugu kaxaynayay
waxay ku geeyeen meel biyo badan, oo dabayshii bari
ayaa badda dhexdeeda kugu jebisay. 27 Maalkaaga, iyo
alaabtaada, iyo baayacmushtarkaaga, iyo baxriyadaada,
iyo doonniyawadayaashaada, iyo kuwa dillaacyada awda,
iyo kuwa baayacmushtarkaaga ka shaqaysta, iyo raggaaga
dagaalyahanka ah oo ku dhex jooga oo dhan, iyo guutada ku
dhex joogta oo dhammuba waxay maalinta baabbi'iddaada
ku wada daadan doonaan badaha dhexdooda. 28 Kuwa
agagaarkaaga jooga oo dhammu waxay la wada gariiri
doonaan qaylada dhawaaqa doonniyawadayaashaada. 29
Oo kuwa seebabka ku shaqeeya oo dhan, iyo baxriyada, iyo
doonniyawadayaasha badda oo dhammuba doonniyahooda
way ka soo degi doonaan, oo berrigay soo istaagi doonaan.
30 Oo waxaa la maqli doonaa iyagoo kuu barooranaya,
oo si qadhaadh ayay u ooyi doonaan, oo madaxooday
boodh ku dul shubi doonaan, oo dambaskay ku galgalan
doonaan. 31 Oo adiga daraaddaa ayay isu xiiri doonaan,
oo joonyado bay guntan doonaan, oo waxay kuugu ooyi
doonaan qalbi murugaysan iyo baroor qadhaadh. 32 Oo
intay ooyayaan ayay baroor kuu qaadi doonaan, oo waxay
ku barooran doonaan iyagoo leh, Turosta badda dhexdeeda
ku baabba'day, bal magaaladee baa la mid ah? 33 Markay
alaabtaadu badda ka soo baxday dad faro badan baad
dhergin jirtay, oo boqorradii dunidana hodan baad maalkaagii
badnaa iyo baayacmushtarkaagii kaga dhigtay. 34 Wakhtigii
badaha lagugu jebiyey biyaha moolka dheer dhexdooda
ayaa baayacmushtarkaagii iyo guutadaadii oo dhammuba
kugu wada dhex baabbi'iyeen. 35 Dadka gasiiradaha deggan
oo dhammu way kula yaabsan yihiin, oo boqorradooduna
aad iyo aad bay u cabsan yihiin, oo wejigooduna aad buu u
argaggaxsan yahay. 36 Oo baayacmushtariyaasha dadka ku
dhex jiraa way kugu foodhyaan, oo cabsi baad noqotay, oo
weligaana mar dambe ma aad jiri doontid.

**28** Oo haddana Eraygii Rabbiga ayaa ii yimid isagoo leh, 2
Wiilka Aadamow, amiirka Turos waxaad ku tidhaahdaa,
Sayidka Rabbiga ahu wuxuu leeyahay, Qalbigaagu kor buu
isu qaaday, oo waxaad tidhi, Anigu Ilaah baan ahay, oo
badaha dhexdooda ayaan kursigii Ilaah ku dul fadhiyaa,
laakiinse waxaad tahay binu-aadmi oo Ilaah ma tihid in
kastoo aad qalbigaagii qalbigii Ilaah oo kale ka dhigtay.
3 Bal eeg, adigu xataa Daanyeel waad ka sii xigmad
badan tahay, oo wax qarsoodi ah oo lagaa qarin karaana
innaba ma jiraan. 4 Xigmaddaada iyo waxgarashadaada
ayaad maalka ku heshay, oo khasnadahaagana waxaad
ku buuxsatay dahab iyo lacag. 5 Xigmaddaada badan iyo
baayacmushtarkaaga ayaad maalkaaga ku sii korodhsatay,
oo qalbigaaguna maalkaaga aawadiis ayuu kor isula qaaday.
6 Sidaas daraaddeed Sayidka Rabbiga ahu wuxuu leeyahay,
Qalbigaagii sidii qalbigii Ilaah oo kale ayaad ka dhigtay, 7
sidaas daraaddeed bal ogow waxaan kugu soo kicin doonaa
shisheeyayaal oo ah kuwa cabsida leh ee quruumaha,
oo iyaguna waxay seeftooda ula soo bixi doonaan inay
quruxda xigmaddaada ku kharribaan, oo dhalaalkaagana
way nijaasayn doonaan. 8 Yamayskay kugu ridi doonaan, oo
waxaad u dhiman doontaa sida dhimashadii kuwii badaha
dhexdooda lagu laayay oo kale. 9 Kan ku dilaya weli ma
hortiisaad ka odhan doontaa, Anigu Ilaah baan ahay, in
kastoo aad binu-aadmi tahay, Ilaahse ma tihid, adoo gacanta
kan ku dilaya ku jira? 10 Waxaad shisheeyayaal gacantooda
ugu dhiman doontaa sida dhimashadii buuryaqabka, waayo,
Sayidka Rabbiga ahu wuxuu leeyahay, Aniga ayaa saas
ku hadlay. 11 Oo haddana Eraygii Rabbiga ayaa ii yimid
isagoo leh, 12 Wiilka Aadamow, boqorka Turos baroor u
qaad, oo waxaad isaga ku tidhaahdaa, Sayidka Rabbiga
ahu wuxuu leeyahay, Adigu waxaad ahayd dhammaystirkii
kaamilnimada, oo waxaa kaa buuxday xigmad, quruxdaaduna
kaamil bay ahayd. 13 Waxaad joogi jirtay Ceeden oo ahayd
beertii Ilaah, oo waxaad huwatay dhagax kasta oo qaali ah,
kuwaasoo ahaa sardiyos, iyo tobasiyos, iyo dheemman, iyo
berullos, iyo onika, iyo yasbid, iyo safayr, iyo sumurud, iyo mid
birqaya, oo dafafkaaga iyo biibiilayaashaada shuqulkoodu
wuu kula jiray. Maalintii lagu abuuray waa laguu diyaariyey.
14 Waxaad ahayd keruubkii subkanaa ee wax dabooli jiray,
oo aniga ayaa saas kaa dhigay si aad buurta quduuska
ah ee Ilaah u joogtid. Oo waxaad hor iyo dib ugu dhex
socon jirtay dhagaxyo dab ah. 15 Maalintii lagu abuuray iyo
ilaa markii xaqdarro lagaa helay jidadkaagaad kaamil ku
ahayd. 16 Baayacmushtarigaaga badan aawadiis waxaa
dhexdaada laga buuxiyey dulmi, waanad dembaabtay, oo
sidaas daraaddeed ayaan adiga sida wax nijaas ah oo
kale buurta Ilaah kaaga xooray. Keruubkii wax dabooli
jirayow, waan ku halligay oo dhagxanta dabka ah dhexdooda
waan kaa baabbi'iyey. 17 Qalbigaagu quruxdaaduu kor
isula qaaday, oo xigmaddaadiina waxaad la kharribtay
dhalaalkaaga. Dhulkaan kugu xooray oo boqorro hortood
ayaan ku dhigay si ay kuu arkaan. 18 Meelahaagii quduuska
ahaa waxaad ku nijaasaysay xumaatooyinkaagii badnaa, iyo

xaqdarradii baayacmushtarkaaga, oo sidaas daraaddeed
dhexdaadaan dab ka soo bixiyey, oo isna wuu ku baabbi'iyey,
oo dhulka korkiisa ayaan dambas kaaga dhigay iyadoo
ay kuwa kuu jeeda oo dhammu indhaha kugu hayaan. **19**
Dadyowga dhexdooda kuwa kugu yaqaan oo dhammu adigay
kula yaabi doonaan, cabsi baad noqotay, oo weligaana
mar dambe ma aad jiri doontid. **20** Oo haddana Eraygii
Rabbiga ayaa ii yimid isagoo leh, **21** Wiilka Aadamow,
wejigaaga Siidoon u jeedi oo iyada wax ka sii sheeg, **22** oo
waxaad tidhaahdaa, Siidoonay, Sayidka Rabbiga ahu wuxuu
leeyahay, Bal eeg, anigu col baan kugu ahaye, oo waa
laygu kaa dhex ammaani doonaa. Oo markaan xukummo
dhexdeeda ku sameeyo waxay ogaan doonaan inaan anigu
Rabbiga ahay, oo dhexdeeda ayaan quduus ku ahaan
doonaa. **23** Belaayo iyo dhiig baan jidadkeeda ku soo dayn
doonaa, oo kuwa dhaawaca ahna dhexdeedaa lagu xukumi
doonaa iyadoo seefu dhinac kastaba kaga taagan tahay,
oo markaasay ogaan doonaan inaan anigu Rabbiga ahay.
**24** Oo mar dambe ma ay jiri doonaan yamaarug reer binu
Israa'iil muda, amase qodax iyaga xanuujisa oo ka mid ah
kuwa hareerahooda ku wareegsan oo iyaga quudhsaday oo
dhan; oo waxay ogaan doonaan inaan anigu ahay Sayidka
Rabbiga ah. **25** Sayidka Rabbiga ahu wuxuu leeyahay,
Markaan reer binu Israa'iil ka soo ururiyo dadyowga ay
ku kala dhex firidhsan yihiin, oo aan dhexdooda quduus
ku noqdo iyadoo ay quruumuhu indhaha ku hayaan, ayay
dalkoodii aan addoonkaygii Yacquub siiyey dhex degganaan
doonaan. **26** Oo halkaasay ammaan ku dhex degganaan
doonaan, oo guryo bay dhisan doonaan, oo beero canab ah
bay beeran doonaan, oo weliba ammaan bay ku degganaan
doonaan, markaan kuwa hareerahooda ku wareegsan oo
iyaga quudhsada oo dhan xukummo ku soo dejiyo, oo
markaasay ogaan doonaan inaan anigu ahay Rabbiga
Ilaahooda ah.

**29** Oo haddana sannaddii tobnaad, bisheedii tobnaad,
maalinteedii laba iyo tobnaad ayaa eraygii Rabbigu
ii yimid isagoo leh, **2** Wiilka Aadamow, wejigaaga u jeedi
Fircoon oo ah boqorka Masar, oo waxaad wax ka sii sheegtaa
isaga iyo dalka Masar oo dhan. **3** La hadal oo waxaad
ku tidhaahdaa, Sayidka Rabbiga ahu wuxuu leeyahay,
Fircoonow, boqorka Masarow, anigu col baan kugu ahaye
bal ogow, waxaad tahay yaxaas weyn oo webiyaashiisa iska
dhex jiifa, oo yidhi, Webigayga anigaa iska leh, oo anigaa
samaystay. **4** Laakiinse qabatooyin baan camanka kaa soo
sudhi doonaa, oo kalluunka webiyaashaadana waxaan ka
dhigi doonaa inuu qolfahaaga ku dhego, oo webiyaashaadaan
kaa soo bixin doonaa adiga iyo kalluunka webiyaashaada
ee qolfahaaga ku wada dhegi doona oo dhan. **5** Oo adiga
iyo kalluunka webiyaashaada oo dhanba cidladaan ku tuuri
doonaa. Waxaad ku dhici doontaa berrin bannaan, oo innaba
layskuma soo kaa ururin doono, lagumana aasi doono, oo
waxaan cunto kaaga dhigay dugaagga dhulka iyo haadka
samada. **6** Oo dadka Masar deggan oo dhammu way wada
ogaan doonaan inaan anigu Rabbiga ahay, maxaa yeelay,
iyagu waxay reer binu Israa'iil u ahaayeen ul cawsduur ah.
**7** Markay gacanta kugu qaateen waad jabtay, oo waxaad
murkicisay garbahoodii oo dhan, oo markay ku cuskadeenna
waad kala jabtay, oo dhexdoodii oo dhanna waad gariirisay.
**8** Sidaas daraaddeed Sayidka Rabbiga ahu wuxuu leeyahay,
Bal ogow, waxaan dushaada ku soo dayn doonaa seef, oo
dad iyo duunyaba waan kaa dhex baabbi'in doonaa. **9** Oo
dalka Masar wuxuu noqon doonaa cidla iyo baabba' oo iyagu
waxay ogaan doonaan inaan anigu Rabbiga ahay, maxaa
yeelay, isagu wuxuu yidhi, Webiga anigaa iska leh, oo anigaa
samaystay. **10** Haddaba sidaas daraaddeed bal ogow, anigu
col baan kugu ahay adiga iyo webiyaashaadaba, oo dalka
Masarna waxaan ka dhigi doonaa baabba' iyo cidla, tan
iyo munaaradda Migdol iyo ilaa Seweeneeh, iyo xataa ilaa
soohdinta Itoobiya. **11** Innaba binu-aadmi cagtiis ma dhex
mari doonto, oo xayawaan cagtiisna ma dhex mari doonto,
oo intii afartan sannadood ah ciduna dhexdiisa ma degi
doonto. **12** Dalka Masar ayaan waddammada cidlada ah
dhexdooda cidla kaga dhigi doonaa, oo magaalooyinkiisuna
afartan sannadood ayay magaalooyinka baabba'ay cidla
ku dhex ahaan doonaan, oo Masriyiintana quruumaha
dhexdooda ayaan ku kala dhex eryi doonaa, oo waxaan
ku dhex firdhin doonaa waddammada. **13** Waayo, Sayidka
Rabbiga ahu wuxuu leeyahay, Markay afartan sannadood
dhammaadaan ayaan Masriyiinta dadyowgii ay ku kala dhex
firidhsanaayeen ka soo ururin doonaa. **14** Oo maxaabiista
Masar baan soo celin doonaa, oo waxaan ka dhigi doonaa
inay dalkii Fatroos oo ah dalkii ay ku dhasheen ku noqdaan,
oo waxay halkaas ku ahaan doonaan boqortooyo hoosaysa.
**15** Oo waxay ahaan doontaa tan boqortooyooyinka ugu
wada hoosaysa, oo mar dambena quruumaha kale iskama
ay kor marin doonto. Iyagaan u dhimi doonaa si ayan
innaba mar dambe quruumaha ugu talin. **16** Oo mar
dambena siima ay ahaan doonto kalsoonidii reer binu Israa'iil
taasoo xumaantoodii soo xusuusisa markay xaggooda
fiiriyaanba, oo waxay ogaan doonaan inaan anigu ahay
Sayidka Rabbiga ah. **17** Oo haddana sannaddii toddoba iyo
labaatanaad, bisheedii kowaad, maalinteedii kowaad ayaa
eraygii Rabbigu ii yimid, isagoo leh, **18** Wiilka Aadamow,

Nebukadresar oo ah boqorka Baabuloon ciidankiisuu hawl
weyn oo Turos ka gees ah ka shaqaysiiyey. Madax kasta
wuu bidaaroobay, oo garab kastana wuu diirmay, laakiinse
isaga iyo ciidankiisii toona Turos mushahaaro uu hawshii
iyada ka gees ahayd ka shaqeeyey kama ay helin. **19** Sidaas
daraaddeed Sayidka Rabbiga ahu wuxuu leeyahay, Bal
ogaada, waxaan dalka Masar siin doonaa Nebukadresar oo
ah boqorka Baabuloon, oo isaguna wuxuu qaadan doonaa
barwaaqadeeda, oo maalkeedana wuu boobi doonaa, oo
xoolaheedana booli ahaan buu u kaxaysan doonaa, oo
mushahaaro bay ciidankiisa u noqon doonaan. **20** Dalka
Masar ayaan isaga u siiyey hawshiisii uu hawshooday
aawadeed, maxaa yeelay, aniga ayay ii shaqeeyeen ayaa
Sayidka Rabbiga ahu leeyahay. **21** Oo maalintaas ayaan reer
binu Israa'iil gees u soo bixin doonaa, oo iyaga dhexdooda
ayaan kaaga hadlin doonaa; oo waxay ogaan doonaan inaan
anigu Rabbiga ahay.

**30** Oo haddana Eraygii Rabbiga ayaa ii yimid isagoo
leh, **2** Wiilka Aadamow, wax sii sheeg, oo waxaad
tidhaahdaa, Sayidka Rabbiga ahu wuxuu leeyahay, Hoogga
maalinta u baroorta! **3** Waayo, maalintii waa soo dhow
dahay, maalintii Rabbigu waa soo dhow dahay, waana
maalin daruuro madow leh, oo waxay noqon doontaa
wakhtigii quruumaha. **4** Oo seef baa Masar ku dul dhici
doonta, oo Itoobiyana waxaa jiri doona xanuun weyn, markii
kuwa la laayay ay Masar ku dhex dhacaan, oo markaasaa
maalkeeda badan la qaadan doonaa oo aasaaskeedana
waa la dumin doonaa. **5** Oo waxaa iyaga seef kula dhiman
doona Itoobiya, iyo Fuud, iyo Luud, iyo dadka isku qasan oo
dhan, iyo Kuub, iyo dadka dalka iyaga axdiga la dhigtay. **6**
Rabbigu wuxuu leeyahay, Kuwa dalka Masar tiiriyaa way
dhici doonaan, oo kibirka xooggiisuna hoos buu u soo dhici
doonaa, oo tan iyo Migdol, iyo ilaa Seweeneeh ayay seef
ugu le'an doonaan, ayaa Sayidka Rabbiga ahu leeyahay.
**7** Oo cidla bay ku ahaan doonaan waddammada cidlada
ah dhexdooda, oo magaalooyinkeeduna waxay ku dhex
jiri doonaan magaalooyinka baabba'ay. **8** Markaan Masar
dab ku dhejiyo oo ay caawimayaasheeda oo dhammu
wada baabba'aan waxay ogaan doonaan inaan anigu
Rabbiga ahay. **9** Oo maalintaas waxaa iga ambabbixi doona
wargeeysyo doonniyo fuushan inay cabsiiyaan kuwa reer
Itoobiya oo aan waxba tuhunsanayn, oo waxaa iyaga ku soo
kor degi doona xanuun weyn sidii wakhtigii Masar oo kale,
waayo, bal eeg, waxyaalahaasu way imanayaan. **10** Sayidka
Rabbiga ahu wuxuu leeyahay, Waxaan ka dhigi doonaa in
dadka badan ee Masar ay gacanta Nebukadresar oo ah
boqorka Baabuloon ku dhammaadaan. **11** Isaga iyo dadkiisa
la jira oo ah kuwa ugu nac weyn ee quruumaha ayaa loo
keeni doonaa inay dalka baabbi'iyaan, oo seefahooda ayay
Masar ula bixi doonaan oo waxay dalka ka buuxin doonaan
kuwa la laayay. **12** Oo webiyaashana waan wada engejin
doonaa, oo dalkana gacanta sharrowyada waan ka iibin
doonaa, oo dalka iyo kuwa dhex degganba waxaan ku wada
baabbi'in doonaa gacanta shisheeyayaasha. Aniga Rabbiga
ah ayaa saas ku hadlay. **13** Sayidka Rabbiga ahu wuxuu
leeyahay, Weliba sanamyada waan wada burburin doonaa,
oo ekaamahana Nof baan ka baabbi'in doonaa, oo mar
dambena ma uu jiri doono amiir dalka Masar u taliyaa, oo
dalka Masarna cabsi baan ku soo dejin doonaa. **14** Oo
Fatroos ayaan cidla ka dhigi doonaa, Socanna dab baan
qabadsiin doonaa, oo Noona xukummo baan ku soo dejin
doonaa. **15** Oo waxaan cadhadayda ku dul shubi doonaa
Siin oo ah qalcadda Masar, oo dadka badan oo Noona waan
baabbi'in doonaa. **16** Oo Masarna dab baan ka dhex shidi
doonaa. Siin xanuun weyn bay heli doontaa, Noona waa la
wada burburin doonaa, oo Nofna maalinta oo dhan waa la
cidhiidhin doonaa. **17** Barbaarrada Aawen iyo Fiibesed seef
bay ku le'an doonaan, oo magaalooyinkaasna maxaabiis
ahaan baa loo kaxaysan doonaa. **18** Oo Texafneheesna
maalintaa ku madoobaan doonta, markaan harqoodyada
Masar halkaas ku jejebin doono, kibirka xooggeeduna wuu
ka dhex baabbi'i doonaa, oo iyada daruur baa qarin doonta,
oo gabdhaheedana maxaabiis ahaan baa loo kaxaysan
doonaa. **19** Sidaasaan Masar xukummo ugu soo dejin
doonaa, oo waxay ogaan doonaan inaan anigu Rabbiga
ahay. **20** Oo haddana sannaddii kow iyo tobnaad, bisheedii
kowaad, maalinteedii toddobaad ayaa eraygii Rabbigu ii
yimid isagoo leh, **21** Wiilka Aadamow, Fircoon oo ah boqorka
Masar gacantiisaan jebiyey, oo bal eeg, lama kabin si ay u
bogsato, oo waxba laguma duubin in xoog loo yeelo si ay
seef u qaaddo aawadeed. **22** Sidaas daraaddeed Sayidka
Rabbiga ahu wuxuu leeyahay, Bal eeg, anigu col baan
ku ahay Fircoon oo ah boqorka Masar, oo gacmihiisana
waan jejebin doonaa, tan xoogga leh iyo tii jabtayba, oo
weliba waxaan ka dhigi doonaa in seeftu gacantiisa ka
dhacdo. **23** Oo Masriyiintana waxaan ku kala eryi doonaa
quruumaha dhexdooda, waddammadana waan ku kala dhex
firdhin doonaa. **24** Oo xoog baan u yeeli doonaa gacmaha
boqorka Baabuloon, oo seeftaydana gacantiisaan u dhiibi
doonaa, laakiinse Fircoon gacmihiisaan jejebin doonaa,
oo hortiisuu kaga cabaadi doonaa sida nin dhaawac ahu
uu u cabaado oo kale. **25** Laakiinse gacmaha boqorka
Baabuloon kor baan u qaadi doonaa, oo gacmaha Fircoonna

hoos bay u dhici doonaan, oo markaan seeftayda gacanta boqorka Baabuloon u dhiibo, oo uu dalka Masar ku dul fidiyo, waxay ogaan doonaan inaan anigu Rabbiga ahay. **26** Oo Masriyiinta waxaan ku kala eryi doonaa quruumaha dhexdooda, waddammadana waan ku kala dhex firdhin doonaa, oo waxay ogaan doonaan inaan anigu Rabbiga ahay.

**31** Oo haddana sannaddii kow iyo tobnaad, bisheedii saddexaad, maalinteedii kowaad ayaa eraygii Rabbigu ii yimid isagoo leh, **2** Wiilka Aadamow, Fircoon oo ah boqorka Masar iyo dadkiisa badanba waxaad ku tidhaahdaa, Bal yaad weynaanta kala mid tahay? **3** Bal eeg, kii reer Ashuur wuxuu u ekaa geed kedar ah oo Lubnaan ku dhex yaal, oo wuxuu lahaa laamo qurxoon iyo hoos weyn, oo wuu sarajoog dheeraa, oo dhaladiisuna waxay gaadhay tan iyo daruuraha. **4** Biyaha ayaa bixiyey, oo moolka ayaa koriyey, waayo, webiyada ayaa hareeraha kaga qulqulay meeshii lagu beeray, oo faraqyo yaryar ayay gaadhsiiyeen dhirta duurka ku taal oo dhan. **5** Sidaas daraaddeed sarajooggiisu wuu ka wada sarreeyey dhirta duurka ku taal oo dhan, oo laamihiisuna way tiro badnaayeen, waayo, markuu soo bixiyey laamihiisu waxay la sii dheeraadeen biyaha badan aawadood. **6** Haadka samada oo dhammu buulashooda ayay laamihiisa ka dhex samaysteen, oo dugaagga duurka oo dhammuna laamihiisay gabnahooda ku hoos dhaleen, oo quruumaha waaweyn oo dhammuna hooskiisay degganaayeen. **7** Oo sidaasuu weynaantiisa iyo laamihiisa dheerdheer ugu qurxoonaa, waayo, xididkiisu biyo badan buu u dhowaa. **8** Geedaha kedarka ah ee beerta Ilaah ku dhex yaal ma ay qarin karin isaga, oo geedaha berooshkuna laamihiisa oo kale ma ay lahayn, oo geedaha armoonkuna laamihiisa oo kale ma ay lahayn, oo geedaha beerta Ilaah ku dhex yaal midkoodna quruxdiisa oo kale ma uu lahayn. **9** Waxaan isaga ku qurxiyey laamihiisa badan, si ay dhirtii beerta Ilaah oo Ceeden ah ku dhex tiil oo dhammu isaga ugu wada hinaasaan. **10** Sidaas daraaddeed Sayidka Rabbiga ahu wuxuu leeyahay, Isagaa sarajoog dheeraa, oo dhaladiisiina wuxuu gaadhsiiyey tan iyo daruuraha, oo qalbigiisuna wuxuu la kibray dhererkiisa aawadiis, **11** sidaas daraaddeed isagaan u gacangeliyey kan quruumaha ugu wada xoog badan. Hubaal isagu wuu abaalmarin doonaa. Aniga ayaa sharkiisii aawadiis u eryay. **12** Shisheeyayaashii ahaa kuwii quruumaha ugu nac weynaa ayaa isaga baabbi'iyey oo ka tegey. Buuraha korkooda iyo dooxooyinka dhexdooda oo dhanba waxaa daadsan laamihiisii, oo laamihiisii waxay ku ag jajaban yihiin webiyaasha dalka oo dhan; oo dadyowgii dunida oo dhammuna hooskiisay ka wada dareereen oo isagay ka tageen. **13** Haadka samada oo dhammu waxay ku hoyan doonaan burburkiisa, oo dugaagga duurka oo dhammuna laamihiisay dul saarnaan doonaan. **14** Taasu waa si dhirta biyaha ku ag taal oo dhammu ayan dhererkooda aawadiis kor isugu sii qaadin, ama ayan dhaladooda daruuraha u gaadhsiin, ama aan geedahooda midna dhererkiisa ugu sii taagnaan inta biyaha cabta oo dhan, waayo, kulligood waxaa loo gacangeliyey geeri inay dhulka meelaha ugu hooseeya oo binu-aadmigu ku dhex jiro hoos ugula dhacaan kuwa yamayska ku dhaadhaca. **15** Sayidka Rabbiga ahu wuxuu leeyahay, Maalintii uu She'ool galay waxaan ka dhigay in loo baroorto. Oo moolkii baan aawadiis u daboolay, oo webiyaashiisiina waan celiyey, oo biyihii badnaana waa la joojiyey, oo dadka Lubnaanna waxaan ka dhigay inay isaga u baroortaan, oo dhirtii duurka oo dhammuna isaga aawadiis bay u taag darnaadeen. **(Sheol h7585)** **16** Oo markaan isaga She'ool kula dhex tuuray kuwa yamayska ku dhaadhaca waxaan ka dhigay inay quruumuhu sanqadha dhiciddiisa la wada gariiraan, oo geedaha Ceeden ku yaal oo dhan, oo ah kuwa la doortay oo dhirta Lubnaan ugu wada fiican, kuwaasoo ah inta biyaha cabta oo dhanba, dhulka meelaha ugu hooseeya ayaa loogu wada tacsiyeeyey. **(Sheol h7585)** **17** Oo iyagiina She'ool bay kula dhaadheceen isagii, oo waxay u wada tageen kuwii seefta lagu laayay. Iyagu gacantiisay ahaayeen oo hooskiisay quruumaha dhexdooda ku degganaan jireen. **(Sheol h7585)** **18** Haddaba dhirta Ceeden ku dhex taal bal midkee baad sharafta iyo weynaanta kala mid tahay? Laakiinse adiga waxaa hoos laguula dhaadhicin doonaa dhirta Ceeden ku dhex taal, oo waxaad geli doontaa dhulka meelaha ugu hooseeya. Oo kuwa seefta lagu laayay ayaad buuryaqabyada la dhex jiifi doontaa. Waana Fircoon iyo dadkiisa badan oo dhan, ayaa Sayidka Rabbiga ahu leeyahay.

**32** Oo haddana sannaddii laba iyo tobnaad, bisheedii laba iyo tobnaad, maalinteedii kowaad ayaa eraygii Rabbigu ii yimid isagoo leh, **2** Wiilka Aadamow, Fircoon oo ah boqorka Masar u barooro, oo waxaad isaga ku tidhaahdaa, Adiga waxaa laguu ekaysiiyey aaran libaax oo quruumaha, laakiinse waxaad tahay sida yaxaas badaha ku dhex jira. Webiyaashaadaad la butaacdaa, oo biyahana cagahaagaad ku qastaa, oo webiyaashoodana waad wasakhaysaa. **3** Sayidka Rabbiga ahu wuxuu leeyahay, Shabaggaygaan kugu dul fidin doonaa iyadoo dadyow badan ila jiraan, oo iyaguna shabaggaygay kugu soo bixin doonaan. **4** Oo

markaasaan dhulka kaaga tegi doonaa, oo berrin bannaan
baan kugu xoori doonaa, oo waxaan ka dhigi doonaa
inay haadka samada oo dhammu kugu dul fadhiyaan,
oo dugaagga dunida oo dhan ayaan kaa dherjin doonaa.
5 Oo hilibkaaga ayaan buuraha ku dul dayn doonaa,
oo dooxooyinkana waxaan ka buuxin doonaa taallooyin
meydadkaaga ah. 6 Oo dhiiggaagana waxaan ka waraabin
doonaa dhulka aad ku dhex dabbaalatid iyo tan iyo buuraha,
oo webiyaashuna adigay kaa wada buuxsami doonaan. 7
Oo markaan ku baabbi'iyo ayaan samada dabooli doonaa,
oo xiddigaheedana waan madoobayn doonaa. Qorraxdana
daruur baan ku qarin doonaa, oo dayaxuna iftiinkiisa sooma
bixin doono. 8 Oo Sayidka Rabbiga ahu wuxuu leeyahay,
Iftiimmada dhalaalaya oo samada oo dhan ayaan korkaaga
ku wada madoobayn doonaa, oo dalkaagana gudcur baan ku
soo dejin doonaa. 9 Oo markaan halligaaddii aad quruumaha
ku dhex halligantay u keeno waddammada aadan aqoonin
ayaan dadyow badan qalbigood dhibi doonaa. 10 Hubaal
maalinta dhiciddaada waxaan ka dhigi doonaa inay dadyow
badanu kula yaabaan, oo boqorradooduna aad bay kuugu
baqi doonaan, markaan seeftayda hortooda ku ruxruxo,
oo midkood kastaaba nafsaddiisuu daqiiqad kasta u gariiri
doonaa. 11 Waayo, Sayidka Rabbiga ahu wuxuu leeyahay,
Waxaa kugu soo degi doonta seeftii boqorka Baabuloon. 12
Waxaan ka dhigi doonaa in dadkaaga badanu ay seefaha
kuwa xoogga badan ku wada le'daan. Waxay wada yihiin
kuwa laga cabsado ee quruumaha, oo waxay dhici doonaan
waxa Masar ku kibirtay, oo dadkeeda badan oo dhanna
waa la wada baabbi'in doonaa. 13 Oo xayawaankeeda oo
dhanna biyaha badan dhinacoodaan ka wada baabbi'in
doonaa, oo mar dambe dad cagtiis ma ay qasi doonto oo
duunyo qoobkeedna ma uu qasi doono. 14 Sayidka Rabbiga
ahu wuxuu leeyahay, Markaasaan biyahooda inay miirmaan
ka dhigi doonaa, oo webiyaashoodana waxaan ka dhigi
doonaa inay sida saliid oo kale u shubmaan. 15 Markaan
dalka Masar cidla iyo baabba' ka dhigo, oo uu waddanku
waayo wixii uu ka buuxi jiray, oo markaan wada laayo
waxa dhex deggan oo dhan ayay ogaan doonaan inaan
anigu Rabbiga ahay. 16 Oo Sayidka Rabbiga ahu wuxuu
leeyahay, Taasu waa baroorta iyada loogu barooran doono.
Gabdhaha quruumuhuna way ku barooran doonaan. Waxay
ugu barooran doonaan Masar iyo dadkiisa badan oo dhanba.
17 Oo haddana sannaddii laba iyo tobnaad, maalintii shan
iyo tobnaad oo bisha ayaa eraygii Rabbigu ii yimid isagoo
leh, 18 Wiilka Aadamow, dadka badan ee Masar u barooro,
oo iyaga tuur; xataa Masar iyo gabdhaha quruumaha caanka
ahba waxaad ku dhex tuurtaa dhulka meelaha ugu hooseeya
iyaga iyo kuwa yamayska ku dhaadhacaba. 19 Bal yaad ka
qurux badan tahay? Hoos u dhaadhac, oo buuryaqabyada la
jiifso. 20 Waxay ku dhex dhici doonaan kuwa seefta lagu
laayay, oo seeftaa loo gacangeliyey. Masar iyo dadkeeda
badanba wada jiida. 21 Kuwa xoogga badan madaxdooda
ayaa iyada iyo caawimayaasheeda She'ool kala dhex hadli
doona. Hoos bay u dhaadheceen, wayna jiifaan, iyagoo
buuryaqabyo ah oo seefta lagu laayay. **(Sheol h7585)** 22
Reer Ashuur iyo guutadiisii oo dhammu halkaasay joogaan,
oo qabuurahoodiina iyagay ku wareegsan yihiin, iyagoo
kulligood la laayay, oo seef ku le'day. 23 Qabuurahoodu
waxay ku yaalliin yamayska meelaha ugu hooseeya, oo
guutadiisuna waxay ku wareegsan tahay qabrigiisa. Kuwii
dalka kuwa nool cabsigelin jiray oo dhan waa la wada laayay,
oo seef bay ku le'deen. 24 Waxaana jooga reer Ceelaam
iyo dadkiisa badan oo qabrigiisa ku wada wareegsan oo
dhan. Kuwii dalka kuwa nool cabsigelin jiray oo dhan waa la
laayay oo seef bay ku le'deen. Iyagoo buuryaqabyo ah ayay
dhulka meelaha ugu hooseeya hoos ugu dhaadheceen, oo
ceebtooday kuwa yamayska ku dhaadhaca la qaateen. 25
Sariir baa kuwa la laayay dhexdooda loo diyaariyey isaga
iyo dadkiisa badanba. Qabuurihiisii isagay ku wareegsan
yihiin, oo kulligood iyagoo buuryaqabyo ah ayay seef ku
le'deen, waayo, cabsi bay dalka kuwa nool gelin jireen, oo
ceebtooday kuwa yamayska ku dhaadhaca la qaateen: oo
isaga waxaa la dhigay kuwa la laayay dhexdooda. 26 Halkaas
waxaa jooga reer Mesheg iyo reer Tubal iyo dadkooda
badan oo dhan, oo qabuurahoodiina iyagay ku wareegsan
yihiin, oo kulligood iyagoo buuryaqabyo ah ayay seef ku
le'deen, waayo, cabsi bay dalka kuwa nool gelin jireen. 27
Oo iyagu lama ay jiifsan doonaan kuwa xoogga badan oo
ka le'day kuwa buuryaqabyada ah oo She'ool hoos ugu
dhaadhacay iyagoo hubkoodii dagaalka sita, oo seefahoodii
madaxooda la hoos dhigay, dembigooduna lafahooduu dul
saaran yahay, waayo, iyagu cabsi bay dalka kuwa nool
gelin jireen. **(Sheol h7585)** 28 Laakiinse adigu waxaad ku
dhex jabi doontaa kuwa buuryaqabyada ah, oo waxaad la
jiifsan doontaa kuwa seefta lagu laayay. 29 Halkaas waxaa
jooga reer Edom, iyo boqorradiisii, iyo amiirradiisii oo dhan,
kuwaas oo in kastoo ay xoog badnaayeen la dhinac dhigay
kuwii seefta lagu laayay, oo iyana waxay la jiifsan doonaan
kuwa buuryaqabyada ah iyo kuwa yamayska ku dhaadhaca.
30 Halkaas waxaa jooga amiirradii reer woqooyi oo dhan, iyo
reer Siidoon oo dhan, kuwaas oo hoos ula dhaadhacay kuwii
la laayay. Cabsidii ay xooggoodii wax ku cabsigelin jireen
way ku ceeboobeen, oo waxay la jiifsadaan kuwii seefta
lagu laayay iyagoo buuryaqabyo ah, oo waxay ceebtoodii la

qaateen kuwa yamayska ku dhaadhaca. 31 Sayidka Rabbiga
ahu wuxuu leeyahay, Fircoon iyaguu arki doonaa, oo dadkiisii
badnaa oo dhan ayuu u qalbi qaboobi doonaa. Fircoon iyo
ciidankiisii oo dhan seef baa lagu wada laayay. 32 Waayo,
Sayidka Rabbiga ahu wuxuu leeyahay, Cabsidaydii waxaan
dhex dhigay dalka kuwa nool, oo Fircoon iyo dadkiisa badan
oo dhan ayaa kuwa buuryaqabyada ah dhexdooda lala dhigi
doonaa kuwa seefta lagu laayay.

33 Haddana Eraygii Rabbiga ayaa ii yimid isagoo leh,
2 Wiilka Aadamow, dadkaaga la hadal, oo waxaad
ku tidhaahdaa, Markaan seef dal ku soo daayo, haddii
dadka dalkaasu ay nin iyaga ka mid ah soo soocaan oo
ay waardiye ka dhigtaan, 3 markuu arko seefta dhulka soo
degaysa hadduu buunka yeedhiyo, oo uu dadka u digo, 4
ku alla kii maqla buunka dhawaaqiisa oo aan digtoonaan,
hadday seeftu timaado oo ay isaga nafta ka qaaddo,
dhiiggiisu wuxuu saarnaan doonaa madaxiisa. 5 Buunka
dhawaaqiisuu maqlay, mase digtoonaan, dhiiggiisu isaga uun
buu saarnaan doonaa. Hadduu digtoonaan lahaa, naftiisuu
samatabbixin lahaa. 6 Laakiinse waardiyuhu hadduu arko
seeftii oo soo socota, illowse uusan buunka yeedhin, oo
uusan dadka u digin, hadday seeftu timaado oo ay qof
iyaga ka mid ah nafta ka qaaddo, kaasuu xumaantiisuu
ku dhintaa, laakiinse dhiiggiisa waxaa la weyddiin doonaa
ninkii waardiyaha ahaa gacantiisa. 7 Haddaba Wiilka
Aadamow, waardiye baan reer binu Israa'iil kaaga dhigay,
oo sidaas daraaddeed erayga afkayga ka maqal, oo iyaga
xaggayga uga dig. 8 Markaan mid sharrow ah ku idhaahdo,
Sharrowgow, hubaal waad dhiman doontaa, haddaadan
sharrowga jidkiisa sharka ah kala hadlin oo aadan uga
digin, ninkaas sharrowga ahu xumaantiisuu ku dhiman
doonaa, laakiinse dhiiggiisa gacantaadaan weyddiin doonaa.
9 Habase ahaatee haddaad sharrowga jidkiisa uga digtid
inuu ka soo leexdo aawadeed, laakiinse uusan jidkiisa ka
soo noqon, markaas isagu xumaantiisuu ku dhiman doonaa,
laakiinse adigu naftaadaad samatabbixisay. 10 Sidaas
daraaddeed Wiilka Aadamow, reer binu Israa'iil la hadal, oo
waxaad ku tidhaahdaa, Idinku waxaad ku hadashaan oo
istidhaahdaan, Xadgudubyadayadii iyo dembiyadayadiiba
way na dul saaran yihiin, oo iyaga ayaannu ku dhex
macaluulsan nahay, haddaba bal sidee baannu u noolaan
karaynaa? 11 Waxaad iyaga ku tidhaahdaa, Sayidka Rabbiga
ahu wuxuu leeyahay, Noloshaydaan ku dhaartaye inaanan
innaba farxad ka helayn dhimashada sharrowga, laakiinse
waxaan jeclahay in sharrowgu uu jidkiisa ka soo noqdo oo
uu noolaado. Soo noqda, jidkiinna ka soo noqda, waayo,
reer binu Israa'iilow, bal maxaad u dhimanaysaan? 12
Wiilka Aadamow, waxaad dadkaaga ku tidhaahdaa, Ka
xaqa ah maalintii uu xadgudub sameeyo xaqnimadiisu
ma ay samatabbixin doonto, oo sharrowguna maalintii uu
sharnimadiisa ka soo noqdo sharnimadiisa kuma uu dhex
dhici doono. Oo ka xaqa ahu maalintii uu dembaabo ma uu
kari doono inuu xaqnimadiisa ku noolaado. 13 Markaan ka
xaqa ah ku idhaahdo, Hubaal waad noolaan doontaa, hadduu
xaqnimada isku halleeyo oo uu xumaan sameeyo, markaas
falimihiisii xaqa ahaa lama soo xusuusan doono, laakiinse
wuxuu ku dhiman doonaa xumaantiisii uu sameeyey. 14
Haddana markaan sharrowga ku idhaahdo, Hubaal waad
dhiman doontaa, hadduu dembigiisa ka soo noqdo, oo
uu waxa xaqa ah oo qumman sameeyo, 15 iyo hadduu
sharrowgu rahaamaddii celiyo, oo uu wixii uu dhacay celiyo,
oo uu qaynuunnada nolosha ku socdo, isagoo aan innaba
xumaan samaynayn, markaas hubaal wuu noolaan doonaa,
mana dhiman doono. 16 Oo dembiyadiisii uu sameeyey
midkoodna looma xusuusan doono. Wuxuu sameeyey wax
xaq ah oo qumman, oo hubaal wuu noolaan doonaa. 17
Laakiinse dadkaagu waxay yidhaahdaan, Sayidka jidkiisu ma
qummana, illowse waa iyaga qudhooda waxa aan jidkoodu
qummanayn. 18 Kan xaqa ahu hadduu xaqnimadiisa ka
leexdo oo uu xumaan sameeyo, xumaantiisuu ku dhiman
doonaa. 19 Laakiinse sharrowgu hadduu sharnimadiisa ka
soo noqdo oo uu waxa xaqa ah ee qumman sameeyo,
qummanaantiisuu ku noolaan doonaa. 20 Laakiinse idinku
waxaad tidhaahdaan, Sayidka jidkiisu ma qummana. Reer
binu Israa'iilow, midkiin kastaba waxaan u xukumi doonaa
siday jidadkiisu yihiin. 21 Oo sannaddii laba iyo tobnaad
ee maxaabiisnimadayadii, bisheedii tobnaad, maalinteedii
shanaad ayaa mid Yeruusaalem ka soo baxsaday ii yimid, oo
wuxuu igu yidhi, Magaaladii waa la qabsaday. 22 Oo kan soo
cararay intuusan ii iman markay fiidkii ahayd gacantii Rabbiga
ayaa i dul saarnayd, oo Rabbigu afkayguu furay, oo ilaa
uu aroortii dambe ii yimid ayaa afkaygii furnaa, oo aniguna
mar dambe carrablaawe ma aan ahayn. 23 Oo haddana
Eraygii Rabbiga ayaa ii yimid isagoo leh, 24 Wiilka Aadamow,
meelaha cidlada ah ee dalka reer binu Israa'iil kuwa degganu
waxay yidhaahdaan, Ibraahim nin qudhuhuu ahaa, oo isagu
dalkan buu dhaxlay, laakiinse innagu waynu badan nahay,
oo dalkana innagaa dhaxal ahaan inaloo siiyey. 25 Haddaba
waxaad iyaga ku tidhaahdaa, Sayidka Rabbiga ahu wuxuu
leeyahay, Hilib dhiig leh baad cuntaan, oo sanamyadiinna
ayaad indhaha kor ugu taagtaan, oo dhiig baad daadisaan,
haddaba ma idinkaa dalka dhaxlaya? 26 Seeftiinnaad isku
hallaysaan, oo wax karaahiyo ah ayaad samaysaan, oo

midkiin kastaaba naagta deriskiisuu nijaaseeyaa, haddaba
ma idinkaa dalka dhaxlaya? 27 Waxaad iyaga ku tidhaahdaa,
Sayidka Rabbiga ahu wuxuu leeyahay, Noloshaydaan ku
dhaartaye, hubaal kuwa meelaha cidlada ah ku dhex jiraa
seef bay ku le'an doonaan, oo kii berrin bannaan joogana
dugaaggaan inay cunaan u siin doonaa, oo kuwa qalcadaha
iyo boholaha ku jiraana belaayo bay u dhiman doonaan. 28
Oo dalka cidla iyo yaab baan ka dhigi doonaa, oo kibirka
xooggiisuna wuu dhammaan doonaa, oo buuraha reer
binu Israa'iilna cidla bay noqon doonaan, si aan ciduna
u dhex marin. 29 Oo markaan dalka cidla iyo yaab uga
dhigo waxyaalahoodii karaahiyada ahaa ee ay sameeyeen
aawadood waxay ogaan doonaan inaan anigu Rabbiga
ahay. 30 Oo weliba Wiilka Aadamow, dadkaagu derbiyada
dhinacooda iyo guryaha irdahooda ayay kugu hadal hayaan,
oo midkoodba wuxuu kan kale ku yidhaahdaa, oo midba
walaalkiis ku yidhaahdaa, Waan ku baryayaaye bal kaalay
oo maqal waxa uu yahay erayga Rabbiga ka imanayaa!
31 Waxay kuugu yimaadaan sida dadku u yimaado, oo
waxay hortaada u fadhiistaan sida dadkayga oo kale,
oo erayadaadana way maqlaan, laakiinse innaba ma ay
yeelaan, waayo, afkooda ayay jacayl badan ku muujiyaan,
laakiinse qalbigoodu wuxuu daba galaa faa'iidadooda. 32
Bal eeg, waxaad iyaga u tahay sida balwo caashaq ah
oo uu mid cod wanaagsan oo alaab muusikeed si wacan
ugu cayaari yaqaan ku balweeyo, waayo, erayadaada way
maqlaan, laakiinse innaba ma ay yeelaan. 33 Oo markay
waxyaalahaasu noqdaan, (bal eeg, way iman doonaane, )
waxay ogaan doonaan in nebi uu iyaga dhex joogay.

34 Oo haddana Eraygii Rabbiga ayaa ii yimid isagoo leh,
2 Wiilka Aadamow, adhijirrada reer binu Israa'iil wax
ka sii sheeg. Wax ka sii sheeg, oo waxaad adhijirrada ku
tidhaahdaa, Sayidka Rabbiga ahu wuxuu leeyahay, Waxaa
iska hoogay adhijirrada reer binu Israa'iil oo iyagu isquudiya!
Miyaanay adhijirrada ku habboonayn inay adhiga daajiyaan?
3 Idinku baruurtaad iska cuntaan, oo dhogortana waad
xidhataan, oo jarkaad qalataan, laakiinse adhiga ma aad
daajisaan. 4 Idinku kii cudur qabay ma aydaan xoogayn,
oo kii bukayna ma aydaan bogsiin, oo kii jabnaana ma
aydaan kabin, oo kii baxsadayna sooma aydaan celin, oo
kii baadiyoobayna ma aydaan doondoonin, laakiinse xoog
iyo cadaadin ayaad iyaga ugu taliseen. 5 Oo wax kala
firdheen, maxaa yeelay, adhijir ma ay lahayn, oo waxay
cunto u noqdeen dugaaggii duurka oo dhan markay kala
firidhsanaayeen. 6 Idahaygii waxay ku dul wareegeen
buuraha oo dhan iyo kur kasta oo dheerba; oo adhigaygii
wuxuu ku kala firidhsanaa dhulka oo dhan, mana jirin cid
raadisa oo doondoonta. 7 Sidaas daraaddeed, Adhijirradow,
bal erayga Rabbiga maqla, 8 Sayidka Rabbiga ahu wuxuu
leeyahay, Noloshaydaan ku dhaartaye, idahaygii waxay
noqdeen wax la dhaco, oo idahaygii waxay cunto u noqdeen
dugaagga duurka oo dhan, maxaa yeelay, adhijir ma ay
lahayn, oo adhijirradayduna ma ay doondoonin, laakiinse
adhijirradii way isquudiyeen, adhigaygana ma ay daajin. 9
Sidaas daraaddeed, Adhijirradow, bal erayga Rabbiga maqla.
10 Sayidka Rabbiga ahu wuxuu leeyahay, Bal eega, anigu
adhijirradaan col ku ahaye, oo adhigaygiina gacantoodaan
weyddiin doonaa, oo waxaan iyaga ka joojin doonaa inay
idaha daajiyaan, oo adhijirraduna mar dambe isma quudin
doonaan. Adhigaygaan afkooda ka samatabbixin doonaa, si
uusan cunto ugu noqonin. 11 Waayo, Sayidka Rabbiga ahu
wuxuu leeyahay, Bal eega, aniga, xataa aniga qudhayda
ayaa idahayga raadin doona oo doondooni doona. 12 Sida
adhijir adhigiisa u doondoono maalintii uu dhex joogo idihiisa
kala firidhsan, sidaas oo kalaan idahayga u doondooni
doonaa, oo waxaan ka soo samatabbixin doonaa meelihii ay
maalintii cadarka iyo gudcurka ahayd ku kala firdheen oo
dhan. 13 Oo iyagaan dadyowga ka soo dhex bixin doonaa, oo
waddammadaan ka soo wada ururin doonaa, oo dalkoodaan
keeni doonaa, oo waxaan daajin doonaa buuraha reer binu
Israa'iil, iyo webiyaasha dhinacooda, iyo dalka meelihiisa la
deggan yahay, oo dhan. 14 Waxaan iyaga daajin doonaa
meelo daaqsin wanaagsan, oo xeradooduna waxay ahaan
doontaa buuraha dhaadheer oo reer binu Israa'iil. Halkaasay
xero wanaagsan dhex fadhiisan doonaan, oo waxay daaqsin
wanaagsan ka daaqi doonaan buuraha reer binu Israa'iil.
15 Aniga qudhaydu adhigayga waan daajin doonaa oo
dhereg baan la fadhiisin doonaa, ayaa Sayidka Rabbiga ahu
leeyahay. 16 Kii baadiyoobay baan raadin doonaa, oo kii
baxsadayna waan soo celin doonaa, kii jabayna waan kabi
doonaa, oo kii bukayna waan xoogayn doonaa, laakiinse ka
buuran iyo ka xoogga leh waan wada baabbi'in doonaa, oo
caddaalad baan ku daajin doonaa. 17 Sayidka Rabbiga ahu
wuxuu leeyahay, Adhigaygow, bal eega, anigu waxaan kala
xukumi doonaa ido iyo riyo, iyo xataa wanan iyo orgiyoba.
18 Ma wax yar bay idinla tahay inaad daaq wanaagsan
daaqdaan, laakiinse aad daaqa idiin hadha cagaha kula
tumataan? iyo inaad biyo saafi ah iska cabtaan, laakiinse aad
inta idiin hadha cagaha ku qastaan? 19 Bal eega, adhigaygu
wuxuu daaqaa wixii aad cagaha kula tumateen, oo wuxuu
cabbaa wixii aad cagaha ku qasteen. 20 Sidaas daraaddeed
Sayidka Rabbiga ahu wuxuu iyaga ku leeyahay, Aniga,
xataa aniga qudhayda ayaa idaha buurbuuran iyo idaha

caatada ah kala xukumi doona. 21 Maxaa yeelay, waxaad iyaga ku riixdaan dhinac iyo garab, oo kuwa cudurka qaba oo dhanna geesihiinnaad ku hardidaan ilaa aad kulligood kala firdhisaan. 22 Sidaas daraaddeed adhigayga waan badbaadin doonaa, oo mar dambena wax la dhaco siima uu ahaan doono, oo waxaan kala xukumi doonaa ido iyo riyo. 23 Oo waxaan iyaga u yeeli doonaa adhijir keliya oo iyaga jira, oo isaguna wuu daajin doonaa, oo kaasu waa addoonkayga Daa'uud. Isagaa daajin doona, oo adhijir buu u ahaan doonaa. 24 Oo aniga Rabbiga ahu Ilaahooda baan ahaan doonaa, oo addoonkayga Daa'uudna wuxuu ahaan doonaa amiir dhexdooda jooga. Aniga Rabbiga ah ayaa saas ku hadlay. 25 Oo waxaan iyaga la dhigan doonaa axdi nabdeed, waxaanan ka dhigi doonaa in dugaag baas ay dalka ka dhex baabba'aan. Cidladay ammaan ku degganaan doonaan, oo kaynta dhexdeedana way iska seexan doonaan. 26 Oo iyaga iyo meelaha buurtayda ku wareegsanba barako baan ka dhigi doonaa, oo roobkana xilligiisaan u soo di'in doonaa, oo waxaa jiri doona tiixo barakee. 27 Dhirta duurku midhay dhali doontaa, oo dhulkuna wax badan buu soo bixin doonaa, oo iyaguna ammaan bay dalkooda ku dhex joogi doonaan, oo markaan xadhkaha harqoodkooda kala gooyo, oo aan gacanta kuwii iyaga addoonsan jiray ka soo samatabbixiyo, waxay ogaan doonaan inaan anigu Rabbiga ahay. 28 Oo iyagu mar dambe wax la dhaco quruumaha uma ay ahaan doonaan, oo dugaagga dalku ma ay cuni doonaan, laakiinse ammaan bay ku degganaan doonaan, oo ciduna innaba kama cabsiin doonto. 29 Oo waxaan iyaga u soo bixin doonaa geed caan ah, oo mar dambena dalka dhexdiisa abaar uguma ay baabbi'i doonaan, oo kol dambe ceebtii quruumaha ma ay sidan doonaan. 30 Oo Sayidka Rabbiga ahu wuxuu leeyahay, Waxay markaas ogaan doonaan in anigoo Rabbiga Ilaahooda ah aan iyaga la jiro, iyo in iyagoo reer binu Israa'iil ah ay dadkaygii yihiin. 31 Oo Sayidka Rabbiga ahu wuxuu leeyahay, Idahaygiiyow, idihii daaqsintaydow, waxaad tihiin binu-aadmi, oo aniguna waxaan ahay Ilaahiinna.

**35** Oo haddana Eraygii Rabbiga ayaa ii yimid isagoo leh, 2 Wiilka Aadamow, wejigaaga Buur Seciir u jeedi, oo iyada wax ka sii sheeg, 3 oo waxaad ku tidhaahdaa, Sayidka Rabbiga ahu wuxuu leeyahay, Buur Seciiray, bal eeg, col baan kugu ahaye, oo gacantaydaan kugu fidin doonaa, waxaanan kaa dhigi doonaa cidla iyo yaab. 4 Oo magaalooyinkaaga waan wada dumin doonaa, oo cidla baad ahaan doontaa, oo markaasaad ogaan doontaa inaan anigu Rabbiga ahay. 5 Weligaa had iyo goorba nacayb baad reer binu Israa'iil u qabtay, oo waagii masiibadoodii iyo waagii ay xumaantu dhammaatay ayaad reer binu Israa'iil xooggii seefta u gacangelisay, 6 sidaas daraaddeed Sayidka Rabbiga ahu wuxuu leeyahay, Noloshaydaan ku dhaartaye, Anigu dhiig baan kuu diyaarin doonaa, oo dhiig baa ku eryan doona. Dhiig baad nebcaan weyday oo sidaas aawadeed dhiig uun baa ku eryan doona. 7 Sidaasaan Buur Seciir cidla iyo yaab uga dhigi doonaa, oo waxaan ka baabbi'in doonaa kii dhex mara iyo kii ku soo noqdaba. 8 Oo buurihiisana waxaan ka buuxin doonaa raggiisa la laayay, oo kurahaaga, iyo dooxooyinkaaga, iyo webiyaashaadaba waxaa ku dhici doona kuwa seefta lagu laayay. 9 Weligaaba cidlaan kaa dhigi doonaa, oo magaalooyinkaagana lama degganaan doono, oo markaasaad ogaan doontaa inaan anigu Rabbiga ahay. 10 In kastoo uu Rabbigu halkaas joogay waxaad tidhi, Labadan quruumood iyo labadan waddanba anigaa iska lahaan doona, oo waannu hantiyi doonnaa, 11 sidaas daraaddeed Sayidka Rabbiga ahu wuxuu leeyahay, Noloshaydaan ku dhaartaye, Anigu waxaan wax kuugu samayn doonaa sidii xanaaqaagu ahaa iyo siduu ahaa masayrkii nacaybkaaga ka yimid oo aad iyaga u muujisay, oo markaan ku xukumo ayaan dhexdooda isku garansiin doonaa. 12 Oo waxaad ogaan doontaa inaan anigoo Rabbiga ah maqlay caydaadii aad buuraha reer binu Israa'iil ku cayday oo dhan, adoo lahaa, Iyaga cidlaa laga dhigay, oo annagaa lanoo siiyey inaan baabbi'inno. 13 Afkaagaad ku faantay oo isaga kay weynaysay, oo erayadaadiina waad igu badisay, oo anigu kulligood waan wada maqlay. 14 Sayidka Rabbiga ahu wuxuu leeyahay, Iyadoo dunida oo dhammu ay rayraynayso ayaan cidla kaa dhigi doonaa. 15 Sidaad dhaxalka reer binu Israa'iil ugu rayraysay markuu cidlada noqday sidaas oo kalaan kaa dhigi doonaa. Buur Seciiray, cidla baad noqon doontaa, dhammaantiin adiga iyo reer Edom oo dhammuba, oo markaasay ogaan doonaan inaan anigu Rabbiga ahay.

**36** Oo weliba Wiilka Aadamow, buuraha reer binu Israa'iil wax u sii sheeg, oo waxaad ku tidhaahdaa, Buuraha reer binu Israa'iilow, bal erayga Rabbiga maqla. 2 Sayidka Rabbiga ahu wuxuu leeyahay, Cadowgu wuxuu idinku yidhi, Ahaa, xataa meelihii sarsare oo hore annagaa hanti ahaan u leh. 3 Sidaas daraaddeed wax sii sheeg, oo waxaad tidhaahdaa, Sayidka Rabbiga ahu wuxuu leeyahay, Iyagu cidla bay idinka dhigeen, oo dhinac kastaba way idinka liqeen, si aad quruumaha kale hanti ugu noqotaan, oo waxaa laydinku hadal hayaa bushimaha waranwarrowyada, oo dadyowgaad ceeb u tihiin. 4 Sidaas daraaddeed buuraha reer binu Israa'iilow, bal erayga Sayidka Rabbiga ah maqla.

Sayidka Rabbiga ahu wuxuu ku leeyahay buuraha iyo
kuraha, iyo webiyaasha, iyo dooxooyinka, iyo meelaha
cidlada ah, iyo magaalooyinka laga tegey oo quruumaha
kale ee ku wareegsan wax la dhaco oo la quudhsado u
noqday, **5** sidaas daraaddeed Sayidka Rabbiga ahu wuxuu
leeyahay, Hubaal anigu waxaan dabkii masayrkayga kaga
hadlay wax ka gees ah kuwa quruumaha kale iyo reer
Edom oo dhan, kuwaasoo dalkaygii dhaxal ahaan isaga
qaatay iyagoo aad u faraxsan oo dadkayga quudhsanaya
si ay u dhacaan. **6** Sidaas daraaddeed dalka reer binu
Israa'iil wax ka sii sheeg, oo waxaad buuraha iyo kuraha
iyo webiyaasha iyo dooxooyinkaba ku tidhaahdaa, Sayidka
Rabbiga ahu wuxuu leeyahay, Bal eega, masayrkaygii iyo
cadhadaydii ayaan ku hadlay, maxaa yeelay, idinku waxaad
sidateen ceebtii quruumaha. **7** Sidaas daraaddeed Sayidka
Rabbiga ahu wuxuu leeyahay, Gacan taagan ayaan ku
dhaartay oo idhi, Hubaal quruumaha idinku wareegsanu
ceebtooday sidan doonaan. **8** Laakiinse idinku buuraha reer
binu Israa'iilow, waxaad soo bixin doontaan laamihiinna,
oo waxaad midhihiinna u dhali doontaan dadkayga reer
binu Israa'iil, waayo, iyagu dhaqsay u iman doonaan. **9**
Waayo, bal eega, raalli baan idinka ahay, oo waan idiin soo
noqon doonaa, oo idinkana waa laydin fali doonaa oo waa
laydin beeri doonaa. **10** Oo waxaan idinku badin doonaa
dad ah reer binu Israa'iil oo dhan, xataa kulligoodba, oo
magaalooyinka waa la degi doonaa, meelaha burbursanna
waa la wada dhisi doonaa. **11** Oo waxaan idinku badin
doonaa dad iyo duunyo, oo iyana way sii kordhi doonaan oo
wax bay dhali doonaan, oo dad baan idin dejin doonaa sidii
markii hore, oo waxaan idiin samayn doonaa wax bilowgiinnii
hore ka sii wanaagsan, oo waxaad ogaan doontaan inaan
anigu Rabbiga ahay. **12** Hubaal waxaan ka dhigi doonaa in
dad kugu dul socdo, waana dadkayga reer binu Israa'iil,
oo way ku hantiyi doonaan, oo dhaxalkoodii baad ahaan
doontaa, oo haatan ka dibna mar dambe ma aad gablamin
doontid. **13** Sayidka Rabbiga ahu wuxuu leeyahay, Waxaa
lagu yidhaahdaa, Dalyahow, dadka waad baabbi'isaa oo
quruuntaadiina waad gablamisay, **14** sidaas daraaddeed
Sayidka Rabbiga ahu wuxuu leeyahay, Mar dambe dad ma
aad baabbi'in doontid, oo quruuntaadana mar dambe ma
aad gablamin doontid. **15** Oo Sayidka Rabbiga ahu wuxuu
leeyahay, Waxaan ka dhigi doonaa inaan mar dambe ceebtii
quruumaha dhexdaada laga maqal, oo mar dambena caydii
dadyowga siima aad sidan doontid, oo quruuntaadana mar
dambe ma aad turunturayn doontid. **16** Oo haddana Eraygii
Rabbiga ayaa ii yimid isagoo leh, **17** Wiilka Aadamow,
markii reer binu Israa'iil ay dalkooda dhex degganaayeen
waxay ku nijaaseeyeen socodkooda iyo falimahooda, oo
jidkooduna wuxuu hortayda kula mid ahaa sidii naag caado
qabta xaylkeed oo kale. **18** Sidaas daraaddeed cadhadaydii
iyagaan ugu kor shubay dhiiggii ay dalka ku dhex daadiyeen
aawadiis, iyo sanamyadoodii ay ku nijaaseeyeen aawadood.
**19** Oo markaasaan iyagii quruumaha ku kala dhex firdhiyey,
oo waddammaday ku kala firidhsanaayeen. Waxaan iyaga
u xukumay siduu socodkoodu ahaa iyo siday falimahoodu
ahaayeen. **20** Oo markay quruumihii ay tageenba dhex
galeen, magacayga quduuska ah nijaas bay kaga dhigeen,
waayo, waxaa laga yidhi, Kuwanu waa dadkii Rabbiga oo
dalkiisii ka soo baxay. **21** Laakiinse anaa u naxay magacayga
quduuska ah oo ay reer binu Israa'iil nijaas kaga dhex
dhigeen quruumihii ay tageenba. **22** Sidaas daraaddeed
waxaad reer binu Israa'iil ku tidhaahdaa, Sayidka Rabbiga
ahu wuxuu leeyahay, Reer binu Israa'iilow, anigu taas idinka
aawadiin uma aanan samayn, laakiinse waxaan u sameeyey
magacayga quduuska ah aawadiis, kaasoo aad nijaas kaga
dhex dhigteen quruumihii aad tagteenba. **23** Oo quduus
baan ka dhigi doonaa magacayga weyn oo quruumaha
nijaas laga dhex dhigay, oo aad idinku nijaas kaga dhigteen.
Oo Sayidka Rabbiga ahu wuxuu leeyahay, Quruumuhu
waxay ogaan doonaan inaan anigu Rabbiga ahay markaan
dhexdiinna quduus kaga noqdo iyagoo indhaha ku haya.
**24** Waayo, quruumahaan idinka soo dhex bixin doonaa, oo
waddammadana waan idinka soo ururin doonaa, oo waxaan
idin geeyn doonaa dalkiinnii. **25** Oo markaasaan biyo nadiif
ah idinku kor rushayn doonaa, oo idinna nadiif baad ahaan
doontaan, oo waxaan idinka nadiifin doonaa wasakhdiinnii
oo dhan iyo sanamyadiinnii oo dhanba. **26** Oo weliba waxaan
idin siin doonaa qalbi cusub, oo ruux cusubna waan idin
gelin doonaa; jidhkiinnana qalbigii dhagaxa ahaa baan ka
dhex bixin doonaa, oo waxaan idin siin doonaa qalbi jiidh ah.
**27** Oo Ruuxayga ayaan idin dhex gelin doonaa, oo waxaan
ka dhigi doonaa inaad qaynuunnadayda ku socotaan,
xukummadaydana waad xajin doontaan, waadna samayn
doontaan. **28** Oo waxaad degganaan doontaan dalkii aan
awowayaashiin siiyey, oo dadkaygii baad ahaan doontaan,
aniguna Ilaahiinna baan ahaan doonaa. **29** Oo weliba
wasakhnimadiinna oo dhan waan idinka badbaadin doonaa,
oo waxaan idiinku yeedhi doonaa hadhuudh, waanan badin
doonaa, oo abaarna idinkuma soo dejin doono. **30** Oo
midhaha dhirtana iyo waxa beeraha ka baxaba, waan badin
doonaa, si aydaan mar dambe cay abaareed quruumaha
uga dhex helin. **31** Oo markaasaad jidadkiinnii xunxumaa iyo
falimihiinnii aan wanaagsanayn soo xusuusan doontaan,
oo xumaatooyinkiinna iyo waxyaalihiinna karaahiyada ah

aawadood ayaad iskaraahsan doontaan. **32** Sayidka Rabbiga
ahu wuxuu leeyahay, Taas idinka aawadiin uma aan
sameeyo, bal idinku taas ogaada, reer binu Israa'iilow,
jidadkiinna xunxun aawadood isu ceebsada oo facsharma.
**33** Sayidka Rabbiga ahu wuxuu leeyahay, Maalinta aan
idinka nadiifin doono xumaatooyinkiinna oo dhan waxaan ka
dhigi doonaa in magaalooyinka la degganaado, oo meelihii
burburayna waa la wada dhisi doonaa. **34** Oo dhulkii cidlada
ahaan jirayna waa la beeran doonaa, kaasoo cidlada ku
ahaan jiray wax alla wixii soo dhex maraba. **35** Oo waxaa la
odhan doonaa, Dalkan cidlada ahaan jiray wuxuu noqday
sidii beertii Ceeden oo kale, oo magaalooyinkii dumay
oo burburay oo cidlada ahaa waa la deyray oo waa la
dhex degay. **36** Oo markaasaa quruumaha hareerihiinna ku
hadhay waxay ogaan doonaan in aniga Rabbiga ahu aan
meelihii dumay dhisay, iyo inaan dhulkii cidlada ahaa beeray.
Aniga Rabbiga ah ayaa saas ku hadlay oo waxaasna waan
samayn doonaa. **37** Sayidka Rabbiga ahu wuxuu leeyahay,
Weliba reer binu Israa'iil waxaas bay i weyddiisan doonaan
inaan iyaga u sameeyo, oo dad sidii adhi oo kale ah ayaan
iyaga ku sii badin doonaa. **38** Sida adhiga quduuska ah oo
kale, iyo sida adhiga Yeruusaalem dhex jooga wakhtiga
iidaheeda ayaa magaalooyinkii dumay dad sidii adhi oo kale
ah ugu wada buuxsami doonaan, oo waxay ogaan doonaan
inaan anigu Rabbiga ahay.

**37** Gacantii Rabbiga ayaa i dul saarnayd, oo Ruuxiisuu
kor iigu qaaday, oo igu dhex riday dooxo ay lafo ka
buuxaan, **2** oo hareerahooda ayuu igu wareejiyey, oo bal
eega, waxaa dooxada bannaankeeda yiil lafo aad iyo aad u
tiro badan, oo bal eega, aad iyo aad bay u qallalnaayeen.
**3** Oo wuxuu igu yidhi, Wiilka Aadamow, lafahanu miyey
noolaan karaan? Oo waxaan ugu jawaabay: Sayidow,
Rabbiyow, adaa og. **4** Oo haddana wuxuu igu yidhi, Lafahan
la hadal, oo waxaad ku tidhaahdaa, Lafahan engeganow,
bal erayga Rabbiga maqla. **5** Sayidka Rabbiga ahu wuxuu
lafahan ku leeyahay, Bal eega, neef baan idin gelin doonaa,
oo idinku waad noolaan doontaan. **6** Oo seedaan idin kor
saari doonaa, oo hilib baan idiin yeeli doonaa, oo harag
baan idinku dabooli doonaa, oo neef baan idin gelin doonaa,
oo waad noolaan doontaan, oo waxaad ogaan doontaan
inaan anigu Rabbiga ahay. **7** Sidaas darteed ayaan wax u
sii sheegay sidii laygu amray, oo intaan wax sii sheegayay
ayaa sanqadh weyni yeedhay, oo dhulgariir baa dhacay,
oo lafihiina way isku soo wada urureen, oo lafuba lafteedii
bay u tagtay. **8** Oo intaan fiirinayay ayaa waxaa soo kor
fuulay seedo, oo hilib baana ka dul baxay oo harag baa
ku kor daboolmay, laakiinse neefu kuma jirin. **9** Markaasuu
igu yidhi, Wiilka Aadamow, dabaysha la hadal, la hadal, oo
waxaad dabaysha ku tidhaahdaa, Sayidka Rabbiga ahu
wuxuu leeyahay, Dabayshay, afarta qalbadood ka kaalay
oo kuwan la laayay si ay u soo noolaadaan aawadeed ku
neefso. **10** Sidaas daraaddeed waxaan ku hadlay siduu igu
amray, oo neef baa iyagii soo gashay, oo way soo wada
noolaadeen, oo cagahay ku istaageen, oo waxay ahaayeen
ciidan aad iyo aad u faro badan. **11** Markaasuu igu yidhi,
Wiilka Aadamow, lafahanu waa reer binu Israa'iil oo dhan. Bal
eeg, iyagu waxay yidhaahdaan, Lafahayagii way engegeen,
oo rajadayadiina way go'day, oo waannu wada baabba'nay.
**12** Sidaas daraaddeed hadal oo waxaad ku tidhaahdaa,
Sayidka Rabbiga ahu wuxuu leeyahay, Dadkaygow, bal
eega, qabuurihiinnaan wada furi doonaa, oo qabuurihiinnaan
idinka soo bixin doonaa, waxaanan idin keeni doonaa dalkii
reer binu Israa'iil. **13** Dadkaygow, markaan qabuurihiinna
wada furo, oo aan qabuurihiinna idinka soo bixiyo, waxaad
ogaan doontaan inaan anigu Rabbiga ahay. **14** Ruuxaygaan
idin gelin doonaa, waanad soo noolaan doontaan, oo waxaan
idin keeni doonaa dalkiinnii. Oo markaasaad ogaan doontaan
in aniga Rabbiga ahu aan saas ku hadlay, oo aan weliba
oofiyey, ayaa Rabbigu leeyahay. **15** Oo haddana Eraygii
Rabbiga ayaa ii yimid isagoo leh, **16** Wiilka Aadamow, ul
soo qaad, oo waxaad ku qortaa: Tanu waxay u tahay reer
Yahuudah iyo reer binu Israa'iil oo saaxiibbadiis ah. Oo
haddana ul kale soo qaad, oo waxaad ku qortaa: Tanu waxay
u tahay reer Yuusuf taasoo ah ushii Efrayim, iyo reer binu
Israa'iil oo dhan oo saaxiibbadiis ah. **17** Oo labadoodaba
isku dar oo waxaad isaga dhigtaa ul qudha inay iyagu
gacantaada isku mid qudha ku noqdaan. **18** Oo markay
dadkaagu kula hadlaan oo ay kugu yidhaahdaan, War, maad
noo sheegtid waxa aad xaalkan ula jeeddid? **19** waxaad
ku tidhaahdaa, Sayidka Rabbiga ahu wuxuu leeyahay, Bal
eega, waxaan soo qaadan doonaa usha reer Yuusuf oo
gacanta reer Efrayim ku jirta, iyo qabiilooyinka reer binu
Israa'iil oo isaga saaxiibbadiis ah, oo waxaan ku dari doonaa
usha reer Yahuudah, oo kulligood waxaan isaga wada dhigi
doonaa ul qudha oo gacantayday ku midoobi doonaan. **20**
Oo ulaha aad waxaas ku qortana waa inay gacantaada
ku jiraan iyagoo indhaha ku haya. **21** Oo waxaad iyaga
ku tidhaahdaa, Sayidka Rabbiga ahu wuxuu leeyahay, Bal
ogaada, reer binu Israa'iil waan ka soo dhex bixin doonaa
quruumaha ay tageen, oo intaan dhinac kasta ka soo ururiyo
ayaan dalkoodii keeni doonaa. **22** Oo iyaga quruun qudha
ayaan uga dhigi doonaa dalka buuraha reer binu Israa'iil, oo
boqor qudha ayaa kulligood boqor u wada ahaan doona, oo

mar dambe laba quruumood ma ay kala ahaan doonaan, oo
kol dambe innaba laba boqortooyo uma ay kala qaybsanaan
doonaan. 23 Oo mar dambena iskuma ay nijaasayn
doonaan sanamyadooda, ama waxyaalahooda karaahiyada
ah, ama xadgudubyadooda midkoodna, laakiinse waxaan
ka badbaadin doonaa meelaha ay ku hoydaan oo ay ku
dhex dembaabeen oo dhan, oo waan nadiifin doonaa, oo
sidaasay dadkayga u ahaan doonaan, oo aniguna Ilaahooda
baan ahaan doonaa. 24 Oo addoonkaygii Daa'uud ayaa
iyaga boqor u ahaan doona, oo kulligoodna waxay lahaan
doonaan adhijir qudha; oo weliba xukummadayday ku
dhex socon doonaan, oo qaynuunnadaydana way dhawri
doonaan oo way wada samayn doonaan. 25 Oo waxay dhex
degganaan doonaan dalkii aan addoonkaygii Yacquub siiyey,
oo ay awowayaashiin degganaan jireen, oo weligoodba
halkaasay degganaan doonaan iyaga iyo carruurtooda, iyo
carruurtooda carruurtooduba, oo addoonkaygii Daa'uudna
weligiis amiirkoodii buu ahaan doonaa. 26 Oo weliba axdi
nabdeed baan la dhigan doonaa, oo kaasu wuxuu ahaan
doonaa axdi daa'imis ah oo weligoodba iyaga lala dhigtay.
Oo iyagaan barakayn doonaa, waanan sii badin doonaa, oo
meeshayda quduuska ahna weligeedba waan dhex dhigi
doonaa. 27 Oo taambuuggayguna iyaguu la jiri doonaa, oo
Ilaahoodaan ahaan doonaa, oo iyaguna dadkaygay ahaan
doonaan. 28 Oo quruumuhuna waxay ogaan doonaan in
aniga Rabbiga ahu aan reer binu Israa'iil quduus ka dhigo,
markii meeshayda quduuska ahu ay weligeedba dhexdooda
ku sii taallo.

**38** Oo haddana Eraygii Rabbiga ayaa ii yimid isagoo
leh, 2 Wiilka Aadamow, wejigaaga u jeedi Juuj, oo
dalka Maajuuj deggan oo ah amiirka madaxda u ah Mesheg
iyo Tubal, oo isaga wax ka sii sheeg. 3 Oo waxaad ku
tidhaahdaa, Sayidka Rabbiga ahu wuxuu leeyahay, Juujow,
amiirka madaxda u ah Mesheg iyo Tubalow, bal eeg, col
baan kugu ahaye. 4 Dib baan kuu soo celin doonaa, oo
qabatooyin baan daamanka kaa sudhi doonaa, waanan soo
bixin doonaa adiga, iyo ciidankaaga oo dhan, fardaha iyo
fardooleydaba, iyagoo kulligood dhar dagaaleed xidhan,
oo ah ciidan faro badan oo gaashaammo waaweyn iyo
gaashaammo yaryar sita, oo kulligood seef sita, 5 iyagoo
weliba ay la jiraan reer Faaris iyo reer Kuush iyo reer Fuud,
oo kulligood gaashaan iyo koofiyad bir ah sita, 6 iyo reer
Gomer iyo guutooyinkiisii oo dhan, iyo reer Togarmaah oo
meelaha woqooyi ugu shisheeya deggan iyo guutooyinkiisii
oo dhan, xataa dad faro badan oo kula jira. 7 Isdiyaari,
oo adiga iyo ciidankaaga kugu soo ururay oo dhammu
isdiyaariya, oo adigu madax iyaga u noqo. 8 Oo wakhti dheer
dabadeed ayaa lagu soo booqan doonaa, oo sannadaha
dambe waxaad iman doontaa dalkii seefta laga soo celiyey,
oo dadyow badan laga soo dhex ururiyey oo buuraha reer
binu Israa'iil ku dul yaal, kaasoo weligiisba cidla burbursan
ahaan jiray, laakiinse iyagaa quruumaha laga soo dhex
bixiyey, oo kulligoodna si ammaan ah ayay ku degganaan
doonaan. 9 Adigu waad soo kici doontaa oo waxaad u iman
doontaa sida duufaan oo kale, oo waxaad ahaan doontaa
sida daruur dalka qarisa, adiga iyo guutooyinkaaga oo dhan,
iyo dad faro badan oo kula jiraba. 10 Sayidka Rabbiga
ahu wuxuu leeyahay, Wakhtigaas wax baa maankaaga
ku soo dhici doona, oo waxaad ku fikiri doontaa xeelad
shar ah, 11 oo waxaad odhan doontaa, Waxaan ku kici
doonaa dalka tuulooyinka aan deyrnayn, oo waxaan ku
kici doonaa kuwa xasilloon, oo ammaanka ku deggan, oo
kulligood iska deggan iyagoo aan lahayn derbiyo ku deyran
iyo qataarro iyo irdo, 12 inaan wax ka dhaco, oo aan wax ka
boobo, si aad gacanta ugu dul fidisid meelihii cidlada ahaa
haatanse la degay, iyo dadkii quruumaha laga soo dhex
ururiyey, oo xoolo iyo alaabba helay, oo dhulka dhexdiisa
deggan. 13 Shebaa, iyo Dedaan, iyo baayacmushtariyaasha
Tarshiish, iyo libaaxyadooda yaryar oo dhan waxay kugu
odhan doonaan, Ma waxaad u timid inaad wax dhacdid? Oo
guutadaada ma waxaad u soo urursatay inaad wax boobtid,
iyo inaad lacag iyo dahab iska qaadatid, oo aad xoolo iyo
alaab iska kaxaysatid, iyo inaad wax badan dhacdid? 14
Sidaas daraaddeed Wiilka Aadamow, wax sii sheeg, oo
waxaad Juuj ku tidhaahdaa, Sayidka Rabbiga ahu wuxuu
leeyahay, Markii dadkayga reer binu Israa'iil ay wakhtigaas
si ammaan ah ku degganaadaan, sow taas ogaan maysid?
15 Markaasaad ka soo kici doontaa meeshaada woqooyi ugu
shishaysa adiga iyo dad badan oo kula jira, oo kulligood
fardo fuushan, oo ah guuto faro badan, iyo ciidan xoog
leh. 16 Oo waxaad ku soo kici doontaa dadkayga reer
binu Israa'iil inaad sida daruur oo kale dhulka u qarisid,
oo ugu dambaysta waxay noqon doontaa inaan dalkayga
kugu soo kiciyo, Juujow, si ay quruumuhu ii aqoonsadaan
markii dhexdaada quduus layga dhigo iyagoo indhaha ku
haya. 17 Sayidka Rabbiga ahu wuxuu leeyahay, Adigu ma
waxaad tahay kii aan waa hore addoommadaydii nebiyada
reer binu Israa'iil ahaa kaga hadlay, kuwaas oo waayahaas
sannado badan wax ku sii sheegayay inaan iyaga kugu soo
kicin doono? 18 Laakiinse wakhtiga Juuj uu dalka reer binu
Israa'iil ku soo kici doono ayaan aad iyo aad u cadhoon
doonaa, ayaa Sayidka Rabbiga ahu leeyahay. 19 Waayo,
waxaan ku hadlay masayrkaygii iyo cadhadaydii kululayd,
oo hubaal wakhtigaas waxaa dalka reer binu Israa'iil jiri

doona gariir weyn, 20 oo kalluunka badda, iyo haadda
samada, iyo dugaagga duurka, iyo waxyaalaha dhulka ku
gurguurta oo dhan, iyo dadka dhulka jooga oo dhammuba
waxay ka wada gariiri doonaan hortayda, oo buuruhu way
dumi doonaan, oo meelaha dheerdheeruna way wada dhici
doonaan, oo derbi kastaana dhulkuu ku soo dhici doonaa.
21 Oo Sayidka Rabbiga ahu wuxuu leeyahay, Seef baan
buurahayga oo dhan ugaga yeedhi doonaa, oo nin kastaba
seeftiisu waxay col ku noqon doontaa walaalkiis. 22 Oo
waxaan isaga ku xukumi doonaa belaayo iyo dhiig; oo
isaga, iyo guutooyinkiisa, iyo dadka badan oo isaga la jiraba
waxaan ku soo kor dayn doonaa roob wax qarqinaya, iyo
roob dhagaxyo waaweyn leh, iyo dab, iyo baaruud. 23 Oo
anigu sidaasaan isu weynayn doonaa, oo aan quduus isaga
dhigi doonaa, oo aan quruumo badan is-aqoonsiin doonaa,
oo waxay ogaan doonaan inaan anigu Rabbiga ahay.

39 Haddaba Wiilka Aadamow, Juuj wax ka sii sheeg,
oo waxaad ku tidhaahdaa, Sayidka Rabbiga ahu
wuxuu leeyahay, Juujow, amiirka madaxda u ah Mesheg
iyo Tubalow, bal eeg, col baan kugu ahaye. 2 Dib baan
kuu soo celin doonaa, waanan ku soo kaxaysan doonaa,
oo waxaan kaa soo kicin doonaa meelaha woqooyi ugu
shisheeya, oo buuraha reer binu Israa'iil ayaan ku keeni
doonaa. 3 Oo qaansadaada gacantaada bidix waan ka
tuuri doonaa, oo fallaadhahaagana gacantaada midig baan
ka ridi doonaa. 4 Waxaad ku kor le'an doontaa buuraha
reer binu Israa'iil, adiga iyo guutooyinkaaga oo dhan iyo
dadka kula jiraaba, oo haadka adag ee cayn kasta ah iyo
dugaagga duurka ayaan cunto ahaan kuu siin doonaa inay
ku cunaan. 5 Sayidka Rabbiga ahu wuxuu leeyahay, Adigu
waxaad ku le'an doontaa berrin bannaan, waayo, aniga ayaa
saas ku hadlay. 6 Oo waxaan dab ku soo dayn doonaa
Maajuuj iyo kuwa gasiiradaha ammaanka isaga degganba,
oo iyagu waxay ogaan doonaan inaan anigu Rabbiga ahay.
7 Oo waxaan ka dhigi doonaa in magacayga quduuska ah
dadkayga reer binu Israa'iil dhexdooda lagu ogaado, oo
iyaga uma aan dayn doono inay magacayga mar dambe
nijaaseeyaan, oo quruumuhuna waxay ogaan doonaan inaan
anigu ahay Rabbiga ah Kan Quduuska ah oo reer binu
Israa'iil. 8 Bal eega, Sayidka Rabbiga ahu wuxuu leeyahay,
Wuu imanayaa oo wuu ahaan doonaa, kaasu waa wakhtigii
aan ka sii hadlay. 9 Oo kuwa magaalooyinka reer binu Israa'iil
degganu way soo bixi doonaan, oo waxay dab ku shidan
doonaan oo ay gubi doonaan hubka dagaalka, kuwaasoo ah
gaashaammada yaryar iyo gaashaammada waaweynba, iyo
qaansooyinka iyo fallaadhaha, iyo budhadhka iyo warmaha,
oo intii toddoba sannadood ah ayay dab ku shidan doonaan.
10 Sidaas daraaddeed iyagu duurka qoryo kama ay soo
guran doonaan, oo kayntana waxba kama ay soo goosan
doonaan, waayo, waxay dab ku shidan doonaan hubka
dagaalka, oo waxay boobi doonaan kuwii iyaga boobay,
wayna dhici doonaan kuwii iyaga dhacay, ayaa Sayidka
Rabbiga ahu leeyahay. 11 Oo wakhtigaas waxaan Juuj meel
lagu aaso ka siin doonaa dalka reer binu Israa'iil, taasoo ah
dooxada badda dhankeeda bari loo maro, oo taasuna way
joojin doontaa socotooyinka mara. Oo halkaasaa lagu aasi
doonaa Juuj iyo dadkiisa faraha badan oo dhan, oo waxaa
loo bixin doonaa dooxadii Hamoonjuuj. 12 Oo intii toddoba
bilood ah ayaa reer binu Israa'iil iyaga aasi doonaan, si ay
dalka u nadiifiyaan aawadeed. 13 Oo waxaa iyaga wada
aasi doona dadka dalka deggan oo dhan, oo wakhtiga
lay ammaani doono ayaa taasu sharaf iyaga u noqon
doontaa, ayaa Sayidka Rabbiga ahu leeyahay. 14 Oo waxay
gooni ahaan u sooci doonaan rag had iyo goorba dalka
dhex mara inay meydadka dhulka ku hadhay aasaan, si
ay dalka u nadiifiyaan, oo toddoba bilood dabadeed ayay
wax baadhi doonaan. 15 Oo dalkay dhex marayaan oo
markii qof dad lafihiis arko, wuxuu ka ag taagi doonaa
calaamad, ilamaa kuwa wax aasaa ay dooxada Hamoonjuuj
ku dhex aasaan. 16 Waxaana jiri doonta magaalo magaceeda
la yidhaahdo Hamoonaah. Oo sidaasay dalka u nadiifin
doonaan. 17 Wiilka Aadamow, Sayidka Rabbiga ahu wuxuu
leeyahay, Waxaad la hadashaa haadka cayn kasta ah iyo
dugaagga duurka oo dhan, oo waxaad ku tidhaahdaa, Isa
soo urursada, oo kaalaya, oo waxaad dhinac kasta uga soo
ururtaan allabarigayga aan idiin qalay, kaasoo ah allabari
weyn oo aan buuraha reer binu Israa'iil dul dhigay inaad
hilib cuntaan oo aad dhiig cabtaan aawadeed. 18 Waxaad
cuni doontaan ragga xoogga badan hilibkooda, oo waxaad
cabbi doontaan amiirrada dunida dhiiggooda, kuwaasoo ah
wanan waaweyn, iyo baraar, iyo orgi, iyo dibi, oo kulligood
Baashaan lagu cayiliyey. 19 Oo allabarigayga aan idiin
qalay ayaad ilamaa aad ka dheregtaan baruur ka cuni
doontaan, oo ilamaa aad ku sakhraantaan dhiig ka cabbi
doontaan. 20 Oo Sayidka Rabbiga ahu wuxuu leeyahay,
Miiskayga ayaad waxaad kaga dhergi doontaan fardo iyo
fardooley, iyo rag xoog badan, iyo kuwa dagaalyahanka
ah oo dhanba. 21 Oo ammaantaydana waxaan dhex
dhigi doonaa quruumaha, oo quruumaha oo dhammuna
waxay wada arki doonaan xukunkayga aan sameeyey iyo
gacantayda aan iyaga dul saaray. 22 Oo maalintaas iyo wixii
ka dambeeyaba reer binu Israa'iil sidaasay u ogaan doonaan
inaan anigu ahay Rabbiga Ilaahooda ah. 23 Oo quruumuhuna

waxay ogaan doonaan in reer binu Israa'iil ay maxaabiis u
noqdeen xumaantooda aawadeed, iyo in xadgudubkii ay igu
sameeyeen aawadiis aan wejigayga uga qariyey, oo aan
iyaga gacantii cadaawayaashooda ugu riday, oo ay kulligood
seef ugu le'deen. **24** Waxaan iyaga ku sameeyey oo aan
wejigayga uga qariyey sidii ay wasakhdoodu ahayd iyo sidii
ay xadgudubyadoodu ahaayeen. **25** Sidaas daraaddeed
Sayidka Rabbiga ahu wuxuu leeyahay, Haatan waxaan
soo celin doonaa maxaabiistii reer Yacquub, oo reer binu
Israa'iil oo dhanna waan u wada naxariisan doonaa, oo
magacayga quduuskaa aawadiis ayaan u hinaasi doonaa.
**26** Waxay illoobi doonaan ceebtoodii iyo xadgudubyadii ay
igu xadgudbeen oo dhan markay si ammaan ah dalkooda u
degganaan doonaan, oo aan ciduna ka cabsiin doonin, **27**
markaan dadyowga ka soo dhex kexeeyo, oo aan dalalka
cadaawayaashooda ka soo ururiyo, oo dhexdooda quduus
laygaga dhigo iyadoo ay quruumo badanu indhaha ku
hayaan. **28** Kolkaasay ogaan doonaan inaan anigu ahay
Rabbiga Ilaahooda ah, oo ka dhigay in iyaga maxaabiis
ahaan quruumaha dhexdooda loogu kaxaysto, oo aan
haddana dalkoodii ku soo dhex ururiyey, oo aanan innaba
mar dambe midkoodna halkaas ku soo dayn doonin. **29**
Oo wejigaygana innaba mar dambe iyaga kama aan qarin
doono, waayo, Sayidka Rabbiga ahu wuxuu leeyahay,
Ruuxaygii ayaan reer binu Israa'iil ku dul shubay.

**40** Sannaddii shan iyo labaatanaad ee
maxaabiisnimadayada, sannadda bilowgeedii, bisha
maalinteedii tobnaad, sannaddii afar iyo tobnaad markii
magaalada la qabsaday dabadeed, isla maalintaas qudheeda
waxaa i dul saarnayd gacantii Rabbiga, oo halkaas buu
i keenay. **2** Waxyaalihii Ilaah i tusay wuxuu igu geeyey
dalkii reer binu Israa'iil, oo wuxuu i saaray buur aad u
dheer, taasoo dhankeeda koonfureed ay wax magaalo
dhismeheed u eg ku yiilleen. **3** Oo isagu halkaasuu i
geeyey, oo bal eeg, waxaa meeshaas joogay nin naxaas
u eg, oo gacanta ku haysta xadhig laga sameeyey geed
linen la yidhaahdo, iyo cawsduur wax lagu qiyaaso, oo
iridduu soo istaagay. **4** Oo ninkii wuxuu igu yidhi, Wiilka
Aadamow, waxyaalaha aan ku tusi doono oo dhan indhaha
ku fiiri, oo dhegaha ku maqal, oo qalbiga geli, waayo,
waxaa halkan laguu keenay inaan waxyaalahan ku tuso. Oo
wax alla wixii aad aragtid oo dhanba reer binu Israa'iil u
sheeg. **5** Oo bal eeg, daarta dibaddeeda oo dhan waxaa
ku wareegsanaa derbi, oo ninka gacantiisana waxaa ku
jiray cawsduur wax lagu qiyaaso oo dhererkiisu yahay
lix dhudhun, oo dhudhun kastaaba yahay dhudhun iyo
taako. Markaasuu daarta ballaadhkeedii qiyaasay oo
cawsduur buu ahaa, oo sarajooggeediina wuu qiyaasay
oo cawsduur buu ahaa. **6** Oo wuxuu yimid iriddii xagga
bari u sii jeedday, oo jaranjarradeeduu fuulay, oo wuxuu
qiyaasay iridda marinkeedii, oo ballaadhkiisu wuxuu ahaa
cawsduur, oo iridda kale marinkeediina ballaadhkiisu wuxuu
ahaa cawsduur. **7** Oo qollad kastaba dhererkeedu wuxuu
ahaa cawsduur, oo ballaadhkeeduna wuxuu ahaa cawsduur,
oo qolladahana waxaa u dhexeeyey shan dhudhun, oo
marinka iridda oo balbalada iridda u dhowayd dhankiisa
guduhu wuxuu ahaa cawsduur. **8** Haddana wuxuu qiyaasay
iriddii balbaladeedii oo daarta u jeedday, waxayna ahayd
cawsduur. **9** Oo haddana wuxuu qiyaasay balbaladii iridda,
waxayna ahayd siddeed dhudhun, tiirarkeeduna waxay
ahaayeen laba dhudhun, oo iridda balbaladeeduna daartay
u jeedday. **10** Oo iridda xagga bari qolladeheedana waxay
ahaayeen saddex dhinac ku taal iyo saddex dhinaca kale
ku taal, oo saddexdooduba isku qiyaas bay ahaayeen, oo
tiirarkuna dhankan isku qiyaas bay ku lahaayeen oo dhanka
kalena isku qiyaas bay ku lahaayeen. **11** Oo haddana wuxuu
qiyaasay kadinkii iridda ballaadhkiisii, wuxuuna ahaa toban
dhudhun, oo iridda dhererkeeduna wuxuu ahaa saddex
iyo toban dhudhun. **12** Oo qolladaha darafkii ka horreeyey
dhinaciisuna wuxuu ahaa dhudhun oo darafkii dhinaciisa
kalena wuxuu ahaa dhudhun, oo qolladaha dhinacooduna
wuxuu ahaa lix dhudhun oo dhinaca kalena wuxuu ahaa
lix dhudhun. **13** Oo haddana iridda qollad saqafkeed ilaa
qollad kale saqafkeed ayuu qiyaasay, oo ballaadhkuna
wuxuu ahaa shan iyo labaatan dhudhun albaab ilaa albaab.
**14** Oo haddana wuxuu qiyaasay tiirarkii oo ahaa lixdan
dhudhun, kuwaas oo gaadhay tiirkii barxaddii iridda ku
wareegsanayd. **15** Oo kadinka iridda laga soo galo hortiisa
iyo ilaa barxadda iridda hoose inta u dhaxaysaa waxay
ahayd konton dhudhun. **16** Oo daaqado cidhiidhi ah baa ku
jiray qolladaha iyo tiirarkooda iridda hoose ku wareegsan iyo
meelaha dedan, oo sidaas oo kale daaqaduhu xagga gudaha
way ka wareegsanaayeen, oo tiir kastana waxaa lagu
xardhay geedo timireed. **17** Markaasuu barxaddii dibadda i
geeyey, oo bal eeg, waxaa ku yiil qollado iyo dhul sallax ah
oo barxadda ku wareegsan loo sameeyey. Soddon qolladood
ayaa dhulka sallaxa ah ku tiil. **18** Oo dhulka sallaxa ah oo
irdaha dhinacooda ku yiil oo irdaha ka soo hor jeeday wuxuu
ahaa dhulka sallaxa ah oo hoose. **19** Markaasuu qiyaasay
ballaadhkii iridda hoose horteeda iyo tan iyo barxadda
hoose horteeda dibadda ah, xagga bari iyo xagga woqooyi,
oo wuxuu ahaa boqol dhudhun. **20** Oo barxaddii dibadda
iriddeedii xagga woqooyi u sii jeeddayna wuxuu qiyaasay

dhererkeedii iyo ballaadhkeediiba. 21 Oo qolladaheeduna
waxay ahaayeen saddex dhinac ku taal iyo saddex dhinaca
kale ku taal, oo tiirarkooda iyo meelahooda dedan waxay
la qiyaas ahaayeen iridda kowaad. Dhererkoodu wuxuu
ahaa konton dhudhun, oo ballaadhkooduna wuxuu ahaa
shan iyo labaatan dhudhun. 22 Oo daaqadahooda, iyo
meelahooda dedan, iyo geedahooda timireedba waxay
la qiyaas wada ahaayeen qiyaastii iriddii xagga bari u sii
jeedday, oo waxaa loo fuulay jaranjarro toddoba tallaabo
ah, oo meelahooda dedanna way ku hor yiilleen. 23 Oo
barxadda hoose iriddeeduna waxay ka soo hor jeedday
iriddii kale oo xagga woqooyi iyo xagga bari jirtay, oo irid ilaa
iridda kale ayuu qiyaasay, waxayna ahayd boqol dhudhun.
24 Oo haddana wuxuu i geeyey xaggii koonfureed, oo bal
eeg, waxaa ku tiil irid xagga koonfureed u sii jeedda, oo
tiirarkeedii iyo meelaheedii dednaa wuxuu u qiyaasay sidii
ay qiyaastaasu ahayd oo kale. 25 Oo iyada iyo meelaheeda
dedan oo ku wareegsanuba waxay lahaayeen daaqado, oo
waxay u ekaayeen daaqadahaas kale; dhererku wuxuu
ahaa konton dhudhun oo ballaadhkuna wuxuu ahaa shan
iyo labaatan dhudhun. 26 Oo waxay lahayd jaranjarro
toddoba tallaabo ah oo loo fuulo, oo meelahooda dedanna
way ku hor yiilleen, oo waxay lahayd geedo timireed oo
mid dhinacan kaga yaal, midna dhinacaas kaga yaal, oo
tiirarkeeda ku xardhan. 27 Oo barxadda hoosena waxaa ku
dhex yiil irid xagga koonfureed u sii jeedday, oo irid ilaa
iriddeeda kale ayuu xagga koonfureed u qiyaasay, waxayna
ahayd boqol dhudhun. 28 Markaasuu barxaddii hoose oo
iridda koonfureed ku ag tiil i geeyey, oo iriddii koonfureedna
sida qiyaastaas oo kaluu u qiyaasay. 29 Oo qolladaheedii,
iyo tiirarkeedii, iyo meelaheedii dednaaba sidaas oo
kaluu u qiyaasay, oo iyada, iyo meelaheeda dedan oo ku
wareegsanuba waxay lahaayeen daaqado, oo dhererkeedu
wuxuu ahaa konton dhudhun oo ballaadhkeeduna wuxuu
ahaa shan iyo labaatan dhudhun. 30 Oo meelaha dedan
oo ku wareegsan dhererkoodu wuxuu ahaa labaatan
dhudhun, ballaadhkooduna wuxuu ahaa shan dhudhun.
31 Oo meelaheeda dedanu waxay u sii jeedeen xagga
barxadda dibadda ah, oo tiirarkeedana waxaa ku xardhanaa
geedo timireed, oo jaranjarrada loo fuulaana waxay
lahayd siddeed tallaabo. 32 Oo haddana wuxuu i dhex
geeyey barxaddii hoose oo xagga bari u sii jeedday, oo
iriddiina wuxuu u qiyaasay sidii qiyaastaas oo kale. 33 Oo
qolladaheedii, iyo tiirarkeedii, iyo meelaheedii dednaaba
waxay wada lahaayeen qiyaastaas oo kale, oo iyada iyo
meelaheedii dednaa oo ku wareegsanuba waxay lahaayeen
daaqado, oo dhererkeedu wuxuu ahaa konton dhudhun, oo
ballaadhkeeduna wuxuu ahaa shan iyo labaatan dhudhun.
34 Oo meelaheeda dedanuna waxay u sii jeedeen barxadda
dibadda xaggeeda, oo tiirarkana waxaa ku xardhanaa
geedo timireed oo dhinacan iyo dhinacaasba kaga yaal, oo
jaranjarrada loo fuulaana waxay lahayd siddeed tallaabo. 35
Markaasuu iriddii woqooyi i geeyey, oo sidaas oo kaluu u
qiyaasay 36 qolladaheeda, iyo tiirarkeeda, iyo meelaheeda
dedan, oo waxay lahayd daaqado ku wareegsan, oo
dhererku wuxuu ahaa konton dhudhun, oo ballaadhkuna
wuxuu ahaa shan iyo labaatan dhudhun. 37 Oo tiirarkeedu
waxay u sii jeedeen barxadda dibadda xaggeeda, oo geedo
timireed ayaa tiirarkiisa dhinacan iyo dhinacaasba kaga
xardhanaa, oo jaranjarrada loo fuulaana waxay lahayd
siddeed tallaabo. 38 Oo waxaa jirtay qollad albaabkeedu
ku ag yiil tiirarka irdaha, oo halkaasaa qurbaanka la gubo
lagu maydhay. 39 Oo balbalada iridda dhinaceedan waxaa
yiil laba miis, oo dhinaceedaasna waxaa yiil laba miis, si
korkooda loogu gowraco qurbaanka la gubo, iyo qurbaanka
dembiga, iyo qurbaanka xadgudubka. 40 Oo dhanka dibadda
ah ee kadinka iridda woqooyi loo maro waxaa yiil laba miis,
oo dhanka kale oo balbalada iridda u dhowna waxaa yiil
laba miis oo kale. 41 Iridda dhinacan waxaa yiil afar miis,
oo dhinacaasna waxaa yiil afar miis oo kale, kuwaasoo
ahaa siddeed miis oo allabaryada lagu dul gowracay. 42 Oo
waxaa jiray afar miis oo dhagax la qoray laga sameeyey
oo allabariga la gubo lagu dul diyaariyo, oo dhererkoodu
wuxuu ahaa dhudhun iyo badh, ballaadhkooduna wuxuu
ahaa dhudhun iyo badh, sarajooggooduna wuxuu ahaa
dhudhun, oo korkoodana waxaa la saari jiray alaabta
qurbaanka la gubo iyo allabariga lagu qalo. 43 Oo waxaa
gudaha ugu xidhnaa qabatooyin ballaadhkoodu taako yahay
oo hareerahooda oo dhan kaga wareegsan, oo miisaskii
korkoodana waxaa saarnaa hilibkii qurbaanka. 44 Oo iridda
hoose dibaddeedana waxaa ku yiil qolladihii kuwa gabya oo
barxadda hoose ku yiil, oo mid waxay ku ag tiil iridda woqooyi
oo waxay u sii jeedday xagga koonfureed, oo tanna waxay
ag tiil iridda bari oo waxay u sii jeedday xagga woqooyi.
45 Oo wuxuu igu yidhi, Qolladdan xagga koonfureed u sii
jeedda waxaa iska leh wadaaddada daarta taladeeda haya.
46 Oo qowladda xagga woqooyi u sii jeeddana waxaa iska
leh wadaaddada meesha allabariga taladeeda haya, oo
kuwaasu waa reer Saadooq oo reer Laawi ka mid ah, oo
Rabbiga ugu soo dhowaada inay isaga u adeegaan. 47
Oo haddana wuxuu qiyaasay barxaddii oo dhererkeedu
yahay boqol dhudhun, oo ballaadhkeeduna yahay boqol
dhudhun, oo afar gees ah, oo meeshii allabariguna daartay
ka horraysay. 48 Markaasuu balbaladii daarta i geeyey,

oo wuxuu qiyaasay balbalada tiirarkeedii, oo dhinacan
wuxuu ahaa shan dhudhun, dhinacaasna wuxuu ahaa shan
dhudhun; oo iridda ballaadhkeeduna wuxuu ahaa saddex
dhudhun oo dhinacan ah iyo saddex dhudhun oo dhinacaas
ah. 49 Oo balbalada dhererkeedu wuxuu ahaa labaatan
dhudhun, oo ballaadhkeeduna wuxuu ahaa kow iyo toban
dhudhun, oo jaranjarro baa loogu fuuli jiray, oo tiirarka
waxaa ku ag yiil tiirar waaweyn, mid dhinacan kaga yaal,
midka kalena dhinacaas kaga yaal.

**41** Markaasuu macbudkii i geeyey, oo tiirarkuu qiyaasay,
oo dhinacan ballaadhku wuxuu ahaa lix dhudhun,
oo dhinaca kale ballaadhkuna wuxuu ahaa lix dhudhun,
oo kaasuna wuxuu ahaa taambuugga ballaadhkiisii. 2 Oo
kadinka ballaadhkiisuna wuxuu ahaa toban dhudhun, oo
kadinka dhinacyadiisuna waxay ahaayeen shan dhudhun
oo dhinaca iyo shan dhudhun oo dhinaca kale ah, oo
dhererkiisuu qiyaasay oo wuxuu ahaa afartan dhudhun
oo ballaadhkiisuna wuxuu ahaa labaatan dhudhun. 3 Oo
haddana guduhuu galay oo wuxuu qiyaasay tiir kasta oo
kadinka oo wuxuu ahaa laba dhudhun, oo kadinkuna wuxuu
ahaa lix dhudhun, oo kadinka ballaadhkiisuna wuxuu ahaa
toddoba dhudhun. 4 Oo haddana wuxuu qiyaasay dhererkiisii
oo ahaa labaatan dhudhun, iyo ballaadhkiisii oo ahaa
labaatan dhudhun oo macbudka hortiisa ku yiil; oo wuxuu igu
yidhi, Tanu waa meesha ugu wada quduusan. 5 Markaasuu
qiyaasay daarta derbigeedii oo ahaa lix dhudhun, oo qollad
kasta ballaadhkeedu wuxuu ahaa afar dhudhun oo daarta
dhinac kasta kaga wareegsan. 6 Oo qolladahana waxay
ahaayeen saddex dabaqadood oo midba mid ka sarrayso, oo
dabaqad kastaaba waxay ahayd soddon qolladood, oo waxay
ku yiilleen derbigii qolladaha ee daarta ku wareegsanaa, si ay
u qabsadaan aawadeed, laakiinse iyagu daarta derbigeeda
kuma ay oollin. 7 Oo qolladuhuna way sii ballaadheen inay
daarta kor ugu sii wareegayeen, waayo, wareegga daarta
kor buu u sii kacay isagoo daarta ku wareegsan, sidaas
daraaddeed daarta ballaadhkeedu xagga saruu u sii socday,
oo waxaa qowladda ugu hoosaysa iyo tan ugu sarraysa
lagaga fuulay qowladda dhexe. 8 Haddana waxaan arkay
inay daartu ku dhisnayd meel sallax ah oo sare oo ku
wareegsanayd, oo aasaaska qolladaha dhererkiisu wuxuu
ahaa cawsduur kaamil ah oo ah lix dhudhun oo dhaadheer.
9 Oo qolladaha derbigooda dibadda ah qaradiisuna waxay
ahayd shan dhudhun, oo intii hadhayna waxay ahayd meeshii
qolladaha ee daarta. 10 Oo qolladaha dhexdoodana waxaa
ku tiil meel ballaadhkeedu labaatan dhudhun yahay oo
daarta dhinac kasta kaga wareegsan. 11 Oo qolladaha
albaabbadooduna waxay u sii jeedeen meesha hadhay
xaggeeda, albaab woqooyi buu u sii jeeday oo mid kalena
koonfur buu u sii jeeday, oo meesha hadhay ballaadhkeeduna
wuxuu ahaa shan dhudhun oo hareeraheeda ku wada
wareegsan. 12 Oo dhismihii meesha goonida ka horreeyey
oo galbeedka ku tiil ballaadhkiisu wuxuu ahaa toddobaatan
dhudhun, oo dhismaha derbigiisa ku wareegsan qaradiisuna
waxay ahayd shan dhudhun, oo dhererkiisuna wuxuu
ahaa sagaashan dhudhun. 13 Oo daartii buu qiyaasay,
oo dhererkeedii wuxuu ahaa boqol dhudhun, oo dhismihii
meesha goonida ahayd iyo derbiyadiisiina dhererkoodii
waxay ahaayeen boqol dhudhun. 14 Oo ballaadhka daarta
horteeda iyo meeshii goonida ahayd ee xagga bari u jeedday
waxay ahaayeen boqol dhudhun. 15 Oo haddana wuxuu
qiyaasay dhererkii dhismihii ka soo hor jeeday meeshii
goonida ahayd oo xagga dambe jirtay, iyo balbalooyinkeedii
dhinacan iyo dhinacaasba ka xigay, oo waxay ahaayeen
boqol dhudhun, oo waxaa weheliyey macbudkii hoose iyo
balbalooyinkii barxadda, 16 iyo marinnadii albaabbada, iyo
daaqadihii cidhiidhsanaa, iyo balbalooyinkii ku wareegsanaa
saddexdooda dabaqadoodba, oo marinka albaabka ka soo
hor jeedayba waxaa lagu dahaadhay alwaax ku wareegsan
tan iyo dhulka iyo ilaa daaqadaha inta ka dhex leh, (oo
daaqaduhuna way dednaayeen), 17 iyo albaabka dushiisa,
iyo xataa daarta gudaheeda iyo dibaddeeda, iyo derbiga ku
wareegsan gudaha iyo dibaddaba, qiyaas buu ku qiyaasay.
18 Oo waxaa lagu sharraxay keruubiim iyo geedo timireed, oo
geed timireedba wuxuu ku dhex yiil laba keruub, oo keruub
kastaaba wuxuu lahaa laba weji. 19 Oo mid nin wejigiis u
egu wuxuu u sii jeeday geedka timireed ee dhinacan ku yaal
xaggiisa, oo mid aaran libaax wejigiis u eguna wuxuu u sii
jeeday geedka timireed ee dhinaca kale ku yaal xaggiisa,
oo daarta hareereheeda oo dhanna saasaa lagu wada
sameeyey. 20 Oo dhulka iyo albaabka korkiisa inta ka dhex
leh waxaa lagu sameeyey keruubiim iyo geedo timireed, oo
derbiga macbudkana sidaas oo kale waa loo sharraxay. 21
Oo macbudka tiirarkiisuba waxay ahaayeen afar gees, oo
meesha quduuska ah horteeduna way u ekayd. 22 Meesha
allabariga alwaax bay ahayd, oo sarajooggeedu wuxuu
ahaa saddex dhudhun, dhererkeeduna laba dhudhun, oo
geeseheeda, iyo dhererkeeda, iyo dhinacyadeeduba waxay
wada ahaayeen alwaax. Markaasuu igu yidhi, Kanu waa
miiska Rabbiga hortiisa yaal. 23 Oo macbudka iyo meesha
quduuska ahu waxay lahaayeen laba albaab. 24 Oo labada
albaab midkiiba wuxuu lahaa laba qaybood, kuwaasoo ah
laba qaybood oo isku laalaaban. Albaab wuxuu lahaa laba
qaybood, oo albaabka kalena wuxuu lahaa laba qaybood. 25
Oo waxaa albaabbada macbudka lagu sharraxay keruubiim

iyo geedo timireed, oo u ekaa kuwii derbiyada lagu sharraxay,
oo balbalada dibadda horteedana waxaa ku yiil looxaan
qaro weyn. 26 Oo balbalada dhinacyadeeda waxaa ku yiil
daaqado cidhiidhsan iyo geedo timireed oo dhinacan iyo
dhinacaasba ku yaal oo daarta qolladeheeduna saasoo
kalay ahaayeen, iyo looxaantii qarada weynayd.

42 Oo haddana wuxuu i geeyey barxaddii dibadda
dhankeeda woqooyi, oo wuxuu i geliyey qolladdii
meesha goonida ah ka soo hor jeedday oo dhismaha
xagga woqooyi ka soo hor jeedday. 2 Oo dhinaca dheer oo
dhererkiisu boqol dhudhun ahaa ayaa albaabka woqooyi ku
hor yiil, oo ballaadhkiisuna wuxuu ahaa konton dhudhun. 3
Barxadda gudaha oo dhererkeedu labaatanka dhudhun ahaa
horteeda iyo meesha sallaxa ah barxadda dibadda horteeda
waxaa ku yiil balbalo balbalo kale ka soo hor jeedda oo
saddex dabaqadood ah. 4 Oo qolladaha hortoodana waxaa
ku yiil jid ballaadhkiisu toban dhudhun yahay, dhererkiisuna
boqol dhudhun yahay, oo albaabbadooduna waxay u sii
jeedeen xagga woqooyi. 5 Haddaba qolladaha sare way ka
cidhiidhsanaayeen kuwa hoose iyo kuwa dhexe ee dhismaha,
waayo, balbalooyinku meeshay yareeyeen. 6 Waayo, iyagu
waxay ahaayeen saddex dabaqadood, laakiinse tiirar kuwa
barxadaha la mid ah ma ay lahayn, sidaas daraaddeed
kuwa sare way ka cidhiidhsanaayeen qolladaha hoose iyo
kuwa dhexeba. 7 Oo derbigii dibadda oo ku ag yiil qolladihii
xagga barxadda dibadda u sii jeeday oo xagga hore oo
qolladaha ku yiil dhererkiisu wuxuu ahaa konton dhudhun.
8 Waayo, qolladihii barxadda dibadda ku yiil dhererkoodu
wuxuu ahaa konton dhudhun, oo bal eeg, macbudka hortiisu
waxay ahayd boqol dhudhun. 9 Oo qolladahaas hoostooda
waxaa ku yiil iriddii dhinaca bari laga geli jiray, meeshii
iyaga xagga barxadda looga soo galo. 10 Oo qollado baa
ku yiil derbigii barxadda xagga bari oo ka soo hor jeeda
xagga meesha goonida ah iyo xagga dhismaha. 11 Oo
jidkii hortooda ku yiil wuxuu u ekaa sidii kii qolladaha xagga
woqooyi ku yiil oo kale. Sidooda oo kaluu u dheeraa oo
sidoodoo kaluu u ballaadhnaa, oo meelahooda laga baxo
oo dhammuna waxay ahaayeen sida qaabkoodoo kale
iyo sida albaabbadooda oo kale. 12 Oo qolladihii xagga
koonfureed u sii jeeday albaabbadoodiina waxay lahaayeen
albaab jidka madaxiisa ku yiil, kaasoo ah jidkii derbiga
xagga bari ka soo hor jeeday, markii iyaga la soo galo. 13
Oo markaasuu igu yidhi, Qolladaha woqooyi iyo qolladaha
koonfureed oo meesha goonida ah ka soo hor jeeda waa
qolladaha quduuska ah oo wadaaddada Rabbiga u soo
dhowaadaa ay waxyaalaha quduuska ah ku cunaan, oo
waxay halkaas dhigi doonaan waxyaalaha aad u quduuska
ah, iyo qurbaanka hadhuudhka, iyo qurbaanka dembiga, iyo
qurbaanka xadgudubka, waayo, meeshaasu waa quduus.
14 Oo markii ay wadaaddadu soo galaan waa inaanay
meesha quduuska ah ka bixin inay barxadda dibadda tagaan,
laakiinse waa inay meeshaas dhigtaan dharkooda markay
adeegayaan ay xidhaan, waayo, iyagu waa quduus, oo
waa inay dhar kale xidhaan markay u soo dhowaadaan
waxyaalaha dadka. 15 Haddaba markuu qiyaasiddii daarta
gudaha dhammaystiray ayuu iriddii xagga bari u sii jeedday
iga bixiyey, oo wuxuu qiyaasay hareereheedii oo dhan.
16 Dhankii bari ayuu cawsduurkii qiyaasta ku qiyaasay,
oo wuxuu ahaa shan boqol oo cawsduur, oo cawsduurkii
qiyaasta ayuu ku soo wada wareejiyey. 17 Dhankii woqooyi
cawsduurkii qiyaasta ayuu ku qiyaasay, oo wuxuu ahaa shan
boqol oo cawsduur. 18 Oo dhankii koonfureedna wuu ku
qiyaasay cawsduurkii qiyaasta, oo wuxuu ahaa shan boqol
oo cawsduur. 19 Oo markaasuu dhankii galbeed u leexday,
oo shan boqol oo cawsduur ayuu cawsduurkii qiyaasta
ku qiyaasay. 20 Oo afartii dhinacba wuu ka qiyaasay, oo
waxay lahayd derbi ku wareegsan oo dhererkiisu yahay
shan boqol oo cawsduur, oo ballaadhkiisuna yahay shan
boqol oo cawsduur, wuxuuna u kala dhexeeyey meesha
quduuska ah iyo meesha aan quduuska ahayn.

43 Oo markaas dabadeedna wuxuu i keenay iriddii xagga
bari u sii jeedday. 2 Oo bal eeg, sharaftii Ilaaha reer
binu Israa'iil ayaa xagga bari ka timid, oo codkiisuna wuxuu u
ekaa sidii biyo badan sanqadhood, oo dhulkuna sharaftiisuu
la dhalaalay. 3 Oo waxyaalihii lay tusay waxay u ekaayeen
sidii waxyaalihii hore ee aan arkay; sidii waxyaalihii aan
arkay markuu u yimid inuu magaalada dumiyo ayay u
ekaayeen, oo waxyaalihii aan arkay waxay u ekaayeen sidii
waxyaalihii aan Webi Kebaar agtiisa ku arkay oo kale; oo
aniguna wejigaan u dhacay. 4 Oo sharaftii Rabbigu waxay
daartii ka soo gashay jidkii iriddii xagga bari u sii jeedday.
5 Oo Ruuxii ayaa kor ii soo qaaday, oo wuxuu i geeyey
barxaddii gudaha, oo bal eeg, sharaftii Rabbiga ayaa daartii
buuxisay. 6 Oo waxaan maqlay qof daarta igala soo hadlaya,
oo nin baa i garab taagnaa. 7 Oo wuxuu igu yidhi, Wiilka
Aadamow, halkanu waa meeshii carshigayga, iyo meeshii
cagahayga, iyo meeshii aan reer binu Israa'iil weligay dhex
degganaan doono, oo reer binu Israa'iil ama boqorradoodu
mar dambe magacayga quduuska ah kuma ay nijaasayn
doonaan dhillanimadooda amase meydka boqorradooda
oo meelahooda sare yaal. 8 Waxay iriddooda marinkeeda
ka taageen iriddayda marinkeeda agtiisa, oo tiirkoodiina

waxay ka ag taageen tiirkayga, oo derbigii qudha ayaa
aniga iyo iyaga noo dhexeeyey, oo magacayga quduuska
ahna waxay ku nijaaseeyeen waxyaalahoodii karaahiyada
ahaa ee ay sameeyeen, sidaas daraaddeed cadhadaydii
waan ku baabbi'iyey. 9 Haddaba iyagu bal dhillanimadooda
iyo meydka boqorradooda ha iga fogeeyeen, oo aniguna
weligayba dhexdoodaan degganaan doonaa. 10 Wiilka
Aadamow, bal waxaad reer binu Israa'iil tustaa daarta si ay
xumaatooyinkooda ugu wada ceeboobaan, oo bal tilmaanta
ha qiyaaseen. 11 Oo hadday wixii ay sameeyeen oo dhan
ku ceeboobaan, waxaad tustaa daarta qaabkeeda, iyo
qabanqaabkeeda, iyo meelaha laga baxo, iyo meelaha laga
soo galo, iyo qaabkeeda oo dhan, iyo qaynuunnadeeda oo
dhan, iyo qaabkeeda oo dhan, iyo sharciyadeeda oo dhan,
oo iyagoo indhaha ku haya qor, si ay qaabkeeda oo dhan
u sii dhawraan, oo ay qaynuunnadeeda oo dhan u wada
sameeyaan. 12 Kanu waa sharcigii daarta: buurta dhaladeeda
hareereheeda oo dhammu wuxuu ahaan doonaa waxa
ugu wada quduusan. Bal eeg, kaasu waa sharcigii daarta.
13 Oo kanuna waa qiyaastii meesha allabariga oo lagu
qiyaaso dhudhun dheer kaasoo ah dhudhun iyo taako. Salku
wuxuu ahaan doonaa dhudhun, ballaadhkuna dhudhun, oo
qarka hareeraha ku wareegsanuna taako, oo kaasu wuxuu
ahaan doonaa meesha allabariga aasaaskeeda. 14 Oo
salka uu dhulka ku hayo iyo ilaa qarka hoose wuxuu ahaan
doonaa laba dhudhun, oo ballaadhkuna dhudhun, oo qarka
yar iyo qarka weyn inta u dhexaysaana afar dhudhun, oo
ballaadhkuna dhudhun. 15 Meesha allabariga inteeda sare
waxay ahaan doontaa afar dhudhun, oo meesha allabariga
meesheeda dabka lagu shido iyo ilaa dhankeeda sare
waxaa ku oolli doona afar gees. 16 Oo meesha allabariga
meesheeda dabka lagu shido dhererkeedu wuxuu ahaan
doonaa laba iyo toban dhudhun, oo ballaadhkeeduna laba
iyo toban dhudhun, iyadoo afar gees ah. 17 Oo qarka
dhererkiisuna wuxuu ahaan doonaa afar iyo toban dhudhun,
ballaadhkiisuna afar iyo toban dhudhun, oo weliba afar gees
ah, oo darafka ku wareegsanuna wuxuu ahaan doonaa
nus dhudhun, oo salkuna wuxuu ahaan doonaa dhudhun,
jaranjarraduna waxay u sii jeedi doontaa xagga bari. 18
Markaasuu igu yidhi, Wiilka Aadamow, Sayidka Rabbiga
ahu wuxuu leeyahay, Kuwanu waa qaynuunnada meesha
allabariga maalintay sameeyaan inay qurbaanno la gubo
ku kor bixiyaan oo ay dhiig ku kor rusheeyaan. 19 Sayidka
Rabbiga ahu wuxuu leeyahay, Wadaaddada reer Laawi oo ah
farcankii Saadooq, oo iigu soo dhowaada inay ii adeegaan,
waxaad siisaa dibi yar oo qurbaan dembi loo bixiyo. 20
Oo waa inaad dhiiggiisa wax ka qaaddaa, oo waa inaad
marisaa meesha allabariga afarteeda gees iyo qarka afartiisa
rukun iyo darafkiisa ku wareegsan, oo sidaas waa inaad u
nadiifisaa oo ugu kafaaragguddaa. 21 Oo weliba waxaad
qaaddaa dibiga qurbaanka dembiga ah, oo isaga waa inuu ku
gubaa meeshii loo amray ee daarta oo ah meesha quduuska
ah dibaddeeda. 22 Oo maalinta labaadna waa inaad qurbaan
dembi u bixisaa orgi yar oo aan iin lahayn, oo waa in
meesha allabariga la nadiifiyo sidii dibigii loogu nadiifiyey oo
kale. 23 Oo markaad nadiifinteeda dhammaysid waa inaad
bixisaa dibi yar oo aan iin lahayn iyo wan aan iin lahayn.
24 Oo iyaga waa inaad u dhowaysaa Rabbiga hortiisa, oo
wadaaddaduna waa inay cusbo ku kor shubaan, oo waa inay
qurbaan la gubo Rabbiga ugu bixiyaan. 25 Oo intii toddoba
maalmood ah waa inaad maalin kasta orgi qurbaan dembi ah
diyaarisaa, oo weliba waa in dibi yar iyo wan aan iin lahayn
la diyaariyaa. 26 Intii toddoba maalmood ah waa in meesha
allabariga loo kafaaraggudaa oo la daahiriyaa, oo sidaasaa
quduus looga dhigi doonaa. 27 Oo Sayidka Rabbiga ahu
wuxuu leeyahay, Markay maalmahaasu dhammaadaan,
maalinta siddeedaad iyo intii ka dambaysa wadaaddadu waa
inay meesha allabariga ku kor bixiyaan qurbaannadiinna la
gubo iyo qurbaannadiinna nabaadiinoba, oo aniguna waan
idin aqbali doonaa.

**44** Markaasuu dib igu soo celiyey iriddii dibadda ee
meesha quduuska ah oo xagga bari u sii jeedday, oo
way xidhnayd. 2 Kolkaasaa Rabbigu igu yidhi, Albaabkanu
waa xidhnaanayaa, oo lama furi doono, oo ciduna kama soo
geli doonto, waayo, Rabbiga ah Ilaaha reer binu Israa'iil baa
ka galay, oo sidaas daraaddeed buu u xidhnaanayaa. 3
Xagga amiirka amiir ahaan buu ugu fadhiisan doonaa oo
Rabbiga hortiisa kibis ugu cuni doonaa. Wuxuu ka soo geli
doonaa jidka balbalada ee iridda, oo isla jidkaas ayuu ka bixi
doonaa. 4 Markaasuu i keenay jidkii iridda woqooyi ee daarta
ku hor yiil, oo waan fiiriyey oo bal eeg, sharaftii Rabbiga
ayaa daartii Rabbiga ka buuxsantay, oo aniguna wejigaan u
dhacay. 5 Markaasaa Rabbigu igu yidhi, Wiilka Aadamow,
aad u fiirso, oo bal indhaha ku arag, oo bal dhegaha ku
maqal waxa aan kugu leeyahay ee ku saabsan qaynuunnada
daarta Rabbiga oo dhan, iyo sharciyadeeda oo dhan, oo aad
u fiirso daarta iridda laga soo galo, iyo meesha quduuska ah
meelaheeda laga baxo oo dhan. 6 Oo waxaad caasiyiinta
reer binu Israa'iil ah ku tidhaahdaa, Reer binu Israa'iilow,
Sayidka Rabbiga ahu wuxuu leeyahay, Waxyaalihiinnii
karaahiyada ahaa ee hore ha idinku filnaadeen, 7 waayo,
meeshayda quduuska ah waxaad soo geliseen shisheeyayaal
aan qalbiga ka gudnayn, oo aan jidhka ka gudnaynba
inay soo galaan, oo ay nijaaseeyaan xataa daartayda

markaad bixinaysaan cuntadayda ah baruurta iyo dhiigga,
oo axdigaygii baad ku jebiseen waxyaalihiinnii karaahiyada
ahaa oo dhan. 8 Oo idinku ma aydaan dhawrin adeegiddii
waxyaalahayga quduuska ah, laakiinse waxaad meeshayda
quduuska ah dhigateen kuwo adeegidda idiin dhawra. 9
Sayidka Rabbiga ahu wuxuu leeyahay, Shisheeyaha reer
binu Israa'iil ku dhex jira oo ah shisheeye aan qalbiga ka
gudnayn oo aan jidhka ka gudnayn toona waa inuusan
meeshayda quduuska ah gelin. 10 Oo markay reer binu
Israa'iil baadiyoobeen kuwii reer Laawi oo iga fogaaday, oo
intay iga fogaadeen sanamyadoodii ka daba galay, waxay
sidan doonaan xumaantooda. 11 Laakiinse iyagu waxay
ka dhex adeegi doonaan meeshayda quduuska ah, iyagoo
daarta irdaheeda u taliya, oo daarta ka adeegaya, oo waxay
dadka u gowraci doonaan qurbaanka la gubo iyo allabariga,
oo hortooday u istaagi doonaan inay iyaga u adeegaan. 12
Sayidka Rabbiga ahu wuxuu leeyahay, Waxay iyaga ugu hor
adeegeen sanamyadooda, oo waxay reer binu Israa'iil u
noqdeen xumaan ay ku turunturoodaan, sidaas daraaddeed
ayaan gacantayda ugu qaaday, oo waxay sidan doonaan
xumaantoodii. 13 Oo iyagu iima ay soo dhowaan doonaan inay
ii sameeyaan shuqulkii wadaadnimada, oo waxyaalahayga
quduuska ahna uma ay soo dhowaan doonaan kuwaasoo
ah waxyaalaha ugu quduusan, laakiinse iyagaa sidan doona
ceebtoodii iyo waxyaalahoodii karaahiyada ahaa ee ay
sameeyeen. 14 Laakiinse waxaan iyaga ka dhigi doonaa
kuwo daarta taladeeda haya, oo sameeya hawsheeda
oo dhan, iyo waxa gudaheeda lagu samayn doono oo
dhan. 15 Laakiinse Sayidka Rabbiga ahu wuxuu leeyahay,
Wadaaddadii reer Laawi oo ah farcankii Saadooq oo
adeegiddii meeshayda quduuska ah xajiyey markay reer
binu Israa'iil iga baadiyoobeen, iyagu way ii soo dhowaan
doonaan inay ii adeegaan aawadeed, oo hortayday u soo
istaagi doonaan inay baruurta iyo dhiigga ii soo bixiyaan.
16 Meeshayda quduuska ah way soo geli doonaan, oo
miiskayga way ugu soo dhowaan doonaan inay ii adeegaan,
oo adeegiddaydana way xajin doonaan. 17 Oo markay irdaha
barxadda gudaha soo galaan waa inay dhar linen ah xidhaan,
oo intay irdaha barxadda gudaha iyo daarta gudaheeda ka
adeegayaan waa inaan wax dhogor ahu korkooda taaban.
18 Waa inay madaxa ku duubtaan cimaamado linen ah,
oo dhexdana waa inay surwaallo linen ah ku xidhaan, oo
innaba waa inayan wax ka dhididiya guntaan. 19 Oo markay
barxadda dibadda u soo baxaan taasoo ah barxadda dibadda
ee uu dadku joogo waa inay dharkii ay ku adeegeen iska
bixiyaan, oo waa inay qolladaha quduuska ah dhigaan, oo
waa inay dhar kale gashadaan si ayan dadka kale dharkooda
quduus ugaga dhigin. 20 Oo waa inayan madaxooda xiirin
ama ayan timahoodu inay dheeraadaan u oggolaan, waase
inay timahooda jaraan. 21 Oo markay barxadda gudaha soo
galaanna wadaadna waa inuusan innaba khamri cabbin. 22
Oo waa inayan guursan carmal laga dhintay ama la furay,
laakiinse waa inay guursadaan bikrado reer binu Israa'iil
farcankooda ah amase carmal wadaad qabi jiray. 23 Oo
waa inay dadkayga baraan waxa quduuska ah iyo waxa
aan quduuska ahayn waxay ku kala duwan yihiin, oo waxay
ka dhigi doonaan inay kala gartaan waxa nijaasta ah iyo
waxa nadiifta ah. 24 Oo markay dacwo timaadona waa
inay garsoorid u istaagaan, oo waa inay si xukummadayda
waafaqsan wax u xukumaan, oo iidahayga oo dhanna waa
inay sharciyadayda iyo qaynuunnadaydaba ku dhawraan,
oo sabtiyadaydana waa inay quduus ka dhigaan. 25 Oo
waa inayan qof meyd ah u dhowaan si ayan isu nijaasayn,
laakiinse waxay keliyahoo isu nijaasayn karaan aabbe
daraaddiis, ama hooyo daraaddeed, ama wiil, ama gabadh,
ama walaal, amase gabadh walaashood ah oo aan nin
lahayn. 26 Oo markii la nadiifiyo dabadeed waa inay toddoba
maalmood u tiriyaan. 27 Oo Sayidka Rabbiga ahu wuxuu
leeyahay, Maalintii uu meesha quduuska ah iyo barxadda
gudaha ah galo, si uu meesha quduuska ah uga dhex adeego
aawadeed, waa inuu qurbaankiisii dembiga bixiyaa. 28 Oo
dhaxalkay heli doonaan waa aniga. Anigaa ah dhaxalkoodii,
oo waa inaydaan innaba dalka reer binu Israa'iil hanti ku
siin, waayo, anigaa ah hantidoodii. 29 Oo iyagu waxay
iska cuni doonaan qurbaanka hadhuudhka, iyo qurbaanka
dembiga, iyo qurbaanka xadgudubka, oo wax kasta oo ay
reer binu Israa'iil nidraanba iyagaa iska lahaan doona. 30
Oo wax kasta oo midhaha ugu horreeya cayn kastaba, iyo
qurbaannadiinna oo dhan cayn kasta oo ay yihiinba waxaa
iska leh wadaaddada. Oo cajiinkiinna cadka ugu horreeyana
waa inaad wadaadka siisaan si ay barako reerkiinna ugu
soo degto. 31 Wadaaddadu waa inayan wax iska bakhtiyey,
ama wax bahal dilay haad iyo dugaag midu yahayba cunin.

45 Oo weliba markaad dhulka saami dhaxal ahaan
ugu qaybsataan, waa inaad Rabbiga qurbaan ka
siisaan, kaasoo ah dalka qaybtiisa quduuska ah. Meeshaas
dhererkeedu waa inuu ahaadaa shan iyo labaatan kun
oo cawsduur, oo ballaadhkeeduna waa inuu ahaadaa
toban kun oo cawsduur. Oo meeshaas hareeraheeda ku
wareegsan oo dhammu waa inay quduus wada ahaadaan. 2
Oo waa in taas meesha quduuska ah looga yeelaa jago
dhererkeedu yahay shan boqol, oo ballaadhkeeduna yahay
shan boqol, oo afar gees ah, oo waa in konton dhudhun

agagaarkeeda laga dhigaa. **3** Oo intaasna waa inaad ka
qiyaastaa meel dhererkeedu yahay shan iyo labaatan kun,
ballaadhkeeduna yahay toban kun, oo waxaa dhexdeeda ku
oolli doona meesha quduuska ah taas oo ah meesha ugu
wada quduusan. **4** Waa dalka qaybtiisa quduuska ah, oo
waxaa iska leh wadaaddada ah kuwa meesha quduuska ah
ka adeega oo u soo dhowaado inay Rabbiga u adeegaan.
Oo waxay ahaan doontaa meel ay guryo ka dhistaan,
iyo meel quduus ah oo ay daarta quduuska ahu ku dhex
taal. **5** Oo meesha dhererkeedu yahay shan iyo labaatan
kun oo ballaadhkeeduna yahay toban kun waa inay hanti
ahaan u ahaataa reer Laawi oo daarta ka adeega, taas iyo
labaatan qolladood. **6** Oo hantida magaalada waa inaad
doorataan, taasoo ah meel ballaadhkeedu yahay shan kun
oo cawsduur, oo dhererkeeduna yahay shan iyo labaatan
kun oo cawsduur, oo ay ag taal qaybta quduuska ah, oo
taasna waxaa iska lahaan doona reer binu Israa'iil oo dhan.
**7** Oo meesha qurbaanka quduuska ah iyo meesha ay hantida
magaaladu ku dhex taal dhinacoodan iyo dhinacoodaasba
waxaa iska lahaan doona amiirka, meesha qurbaanka
quduuska ah horteeda iyo meesha ay hantida magaaladu ku
taal horteeda, dhinaca galbeed xaggiisa galbeed iyo dhinaca
bari xaggiisa bariba, oo dhererkoodu waa inuu la mid noqdaa
qaybaha middood soohdinteeda galbeed iyo soohdinteeda
bari inta ka dhex leh. **8** Oo taasu waxay amiirka u ahaan
doontaa hantida uu reer binu Israa'iil ku dhex leeyahay, oo
amiirradayduna waa inayan mar dambe dadkayga dulmin,
laakiinse dalka waa inay reer binu Israa'iil u siiyaan siday
qabiilooyinkoodu kala yihiin. **9** Sayidka Rabbiga ahu wuxuu
leeyahay, Amiirrada reer binu Israa'iilow, intaasu ha idinku
filnaato. Dulmiga iyo dhicidda joojiya, oo garsoorid iyo
caddaalad sameeya, oo baaddiinnana dadkayga ka fogeeya,
ayaa Sayidka Rabbiga ahu leeyahay. **10** Waa inaad kafado
xaq ah iyo eefaah xaq ah iyo bad xaq ah lahaataan. **11**
Oo eefaahda iyo badku waa inay isku qiyaas ahaadaan,
eefaahdu waa inay qaaddaa xomeer toban meelood loo
dhigay meeshiis, oo badkuna waa inuu qaadaa xomeer
toban meelood loo dhigay meeshiis, oo qiyaastuna waa
inay ahaataa sida xomeerka. **12** Oo sheqelkuna waa inuu
ahaadaa labaatan geeraah, oo maanehiinnuna waa inuu
ahaadaa labaatan sheqel, shan iyo labaatan sheqel iyo shan
iyo toban sheqel. **13** Oo qurbaanka aad bixinaysaanna waa
kan: xomeer kasta oo sarreen ahba waa inaad ka bixisaan
eefaah lix meelood loo dhigay meesheed, oo haddana
xomeer kasta oo shaciir ahba waa inaad ka bixisaan eefaah
lix meelood loo dhigay meesheed. **14** Oo amarka saliidduna
waa kan: kor kastaba waa inaad ka bixisaan bad toban
meelood loo dhigay meeshiis. Korkuna waa toban bad, sida
xomeer oo kale. **15** Oo labadii tiro oo ido ahba waa inaad ka
bixisaan wan laga soo kaxeeyey daaqa barwaaqaysan oo
reer binu Israa'iil, oo waa inaad u bixisaan qurbaan hadhuudh
ah, iyo qurbaan la gubo, iyo qurbaanno nabaadiino, si
aad iyaga ugu kafaaragguddaan aawadeed, ayaa Sayidka
Rabbiga ahu leeyahay. **16** Oo dadka dalka deggan oo
dhammu waa inay qurbaankaas amiirka reer binu Israa'iil
siiyaan. **17** Oo amiirka qaybtiisu waxay ahaan doontaa
inuu qurbaannada la gubo, iyo qurbaannada hadhuudhka,
iyo qurbaannada cabniinka bixiyo ayaamaha iidaha iyo
wakhtiga ay biluhu dhashaan, iyo maalmaha sabtiyada, iyo
iidaha reer binu Israa'iil oo dhan. Isagu waa inuu qurbaanka
dembiga, iyo qurbaanka hadhuudhka, iyo qurbaanka la
gubo, iyo qurbaannada nabaadiinada, diyaariyaa, si reer
binu Israa'iil loogu kafaaraggudo. **18** Sayidka Rabbiga ahu
wuxuu leeyahay, Bishii kowaad maalinteedii kowaad waa
inaad dibi yar oo aan iin lahayn soo wadataa, oo waa
inaad meesha quduuska ah nadiifisaa. **19** Oo wadaadku
waa inuu qaar ka soo qaadaa dhiigga qurbaanka dembiga,
oo waa inuu mariyaa daarta tiirarkeeda, iyo meesha
allabariga saldhiggeeda afartiisa gees, iyo tiirarka iridda
barxadda gudaha. **20** Oo waa inaad bisha maalinteeda
toddobaad saas oo kale u samaysaa mid kasta oo qalad
ama aqoonla'aan ku dembaaba. Oo waa inaad sidaas daarta
ugu kafaaragguddaan. **21** Oo bisha kowaad maalinteeda
afar iyo tobnaad waa inaad Iiddii Kormaridda iiddaan, taasoo
ah iid toddoba maalmood ah, waana in la cunaa kibis
aan khamiir lahayn. **22** Oo maalintaas amiirku waa inuu
nafsaddiisa iyo dadka dalka oo dhanba dibi qurbaan dembi
ah u diyaariyaa. **23** Oo toddobada maalmood oo iiddana
waa inuu Rabbiga u diyaariyaa qurbaan la gubo, kaasoo
ah toddoba dibi iyo toddoba wan oo aan iin lahayn oo
uu toddobada maalmoodba maalin kasta diyaariya, oo
maalin kastana waa inuu orgi qurbaan dembi u bixiyaa. **24**
Oo waa inuu qurbaan hadhuudh oo ah eefaah dibiba iyo
eefaah wanba diyaariyaa, oo eefah kastana waa inuu hiin
saliid ah la bixiyaa. **25** Oo bisha toddobaad maalinteeda
shan iyo tobnaadna waa inuu sidaas oo kale sameeyaa
iidda toddobada maalmood ah; waa inuu sameeyaa siduu
qurbaanka dembigu yahay, iyo siduu qurbaanka la gubo
yahay, iyo siduu qurbaanka hadhuudhku yahay, iyo siday
saliiddu tahayba.

**46** Sayidka Rabbiga ahu wuxuu leeyahay, Barxadda
gudaha iriddeeda xagga bari u sii jeeddaa waa inay
lixda maalmood ee la shaqeeyo xidhnaataa, laakiinse

maalinta sabtida waa inay furnaataa, oo maalinta bishu
dhalatona waa inay furnaataa. 2 Oo amiirku waa inuu ka soo
galaa jidka balbalada oo iridda dibadda, oo waa inuu iridda
tiirkeeda ag istaagaa, oo wadaaddadu waa inay qurbaankiisa
la gubo iyo qurbaannadiisa nabaadiinada diyaariyaan, oo
waa inuu iridda marinkeeda ku sujuudaa, oo markaas waa
inuu dibadda u baxaa, laakiinse iridda tan iyo fiidkii waa
inaan la xidhin. 3 Oo maalmaha sabtida iyo maalmaha
biluhu dhashaanba dadka dalka degganu waa inay albaabka
iriddaas Rabbiga hortiisa ku sujuudaan. 4 Oo qurbaanka
la gubo oo uu amiirku maalmaha Sabtida ah Rabbiga u
bixin doono waa inuu ahaadaa lix wan oo yaryar oo aan iin
lahayn iyo wan weyn oo aan iin lahayn. 5 Oo wan kasta
oo weynba waa in lala bixiyaa qurbaanka hadhuudhka oo
eefaah ah, oo wananka yaryar qurbaankooda hadhuudhkana
nin waluba waa inuu intuu bixin karo bixiyaa, oo eefaah
kastana hiin saliid ah waa inuu la bixiyaa. 6 Oo maalinta
bishu dhalatona waa in la bixiyaa dibi yar oo aan iin lahayn,
iyo lix wan oo yaryar iyo wan weyn, oo waa inay kulligood
wada ahaadaan kuwo aan iin lahayn. 7 Oo dibi kasta waa
inuu la diyaariyaa eefaah ah qurbaan hadhuudh oo wan
kastana waa inuu eefaah la diyaariyaa, oo wananka yaryarna
waa inuu in alla intay gacantiisu karto la diyaariyaa, oo
eefaah kastana waa inuu hiin saliid ah la bixiyaa. 8 Oo
amiirku markuu galo waa inuu jidka balbalada oo iriddaas ka
soo galaa, oo haddana waa inuu isla iriddaas jidkeeda ka
baxaa. 9 Laakiinse dadka dalka degganu markay iidaha
Rabbiga hortiisa yimaadaan, kii jidka iridda woqooyi ka
soo galaa, waa inuu jidka iridda koonfureed ka baxaa, oo
kii jidka iridda koonfureed ka soo galaana waa inuu jidka
iridda woqooyi ka baxaa, oo waa inuusan jidkii iriddii uu
ka soo galay dib ugu noqon, laakiinse waa inuu dhanka
isaga ku toosan ka baxaa. 10 Oo amiirku waa inuu iyaga
dhex galaa markay galaan, oo markii ay baxaanna waa
inuu baxaa. 11 Oo iidaha iyo maalmaha waaweyn ee la
amray qurbaanka hadhuudhku waa inuu ahaadaa dibigiiba
eefaah, iyo wankiiba eefaah, oo wananka yaryarna waa inuu
la bixiyaa intuu bixin karo, oo eefaah kastana waa inuu hiin
saliid ah la bixiyaa. 12 Haddaba amiirku markuu diyaariyo
qurbaan ikhtiyaar ah ha ahaatee qurbaan la gubo amase
qurbaanno nabaadiino oo Rabbiga ikhtiyaar loo siiyo, waa in
iridda xagga bari u sii jeedda loo furaa, oo isagana waa
inuu qurbaankiisa la gubo iyo qurbaannadiisa nabaadiino u
diyaariyaa siduu maalinta sabtida yeelo oo kale, oo markaas
waa inuu baxaa, oo markuu baxo dabadeed waa in iridda la
soo xidhaa. 13 Oo adigu waa inaad maalin kasta Rabbiga
qurbaan la gubo ugu diyaarisaa wan gu jira oo aan iin lahayn
oo waa inaad subax kasta kaas diyaarisaa. 14 Oo kaas
waa inaad subax kasta u diyaarisaa qurbaan hadhuudh ah
eefaah lix meelood loo dhigay meesheed iyo hiin saliid ah oo
saddex meelood loo dhigay meeshiis in burka wanaagsan
lagu daro, oo kaasu waa qurbaan hadhuudh oo had iyo
goorba joogta ah oo amar daa'imis ah Rabbiga u ah. 15
Oo sidaas subax kasta waa in qurbaan la gubo oo had
iyo goor joogta ah loo diyaariyaa wanka, iyo qurbaanka
hadhuudhka, iyo saliiddaba. 16 Sayidka Rabbiga ahu wuxuu
leeyahay, Amiirku hadduu wiilashiisa midkood hadiyad siiyo,
taasu waa dhaxalkiisa, oo wiilashiisaa lahaan doona, oo waa
hantidooda ay dhaxal ahaan u leeyihiin. 17 Laakiinse hadduu
dhaxalkiisa hadiyad ka siiyo addoommadiisa midkood,
wuxuu iska yeelan doonaa ilaa sannadda xorriyadda oo
dabadeedna waxay u noqon doontaa amiirkii, laakiinse
dhaxalkiisa waxaa iska lahaan doona wiilashiisa oo qudha.
18 Oo weliba amiirku waa inuusan dadka dhaxalkooda wax
uga qaadan si uu iyaga hantidooda uga bixiyo, laakiinse
amiirkii waa inuu hantidiisa wiilashiisa ka dhaxalsiiyaa, si aan
dadkaygu nin kastaba hantidiisa uga firdhin. 19 Markaasuu
i dhex mariyey iriddii kadinka dhiniciisa ku tiil, oo wuxuu
i geeyey qolladihii quduuska ahaa oo wadaaddada oo
xagga woqooyi u sii jeeday, oo bal eeg, meel baa ku tiil
dhankooda dambe ee galbeed. 20 Oo wuxuu igu yidhi, Tanu
waa meesha ay wadaaddadu qurbaanka xadgudubka iyo
qurbaanka dembiga ku karin doonaan, oo ay qurbaanka
hadhuudhka ku dubi doonaan, si ayan barxadda dibadda
ugu bixin oo ayan dadka quduus uga dhigin. 21 Oo haddana
wuxuu ii soo bixiyey barxaddii dibadda, oo wuxuu ka dhigay
inaan barxadda afarteedii rukun ku soo wareego, oo bal
eeg, barxadda rukunkeed kastaba barxad baa ku tiil. 22
Oo barxadda afarteeda rukunba waxaa ku yiil barxado
kala xeraysan oo dhererkoodu afartan dhudhun yahay
oo ballaadhkooduna soddon dhudhun yahay, oo afartaas
barxadood ee rukummada ku tiil isku qiyaas bay ahaayeen.
23 Oo hareerahooda oo dhanna waxaa laga dhisay meel
safan oo afartoodaba way ku wareegsanaayeen, oo safafka
ku wareegsanna waxaa laga hoos sameeyey meelo wax
lagu kariyo. 24 Markaasuu igu yidhi, Kuwanu waa meelaha
wax lagu kariyo, oo ay midiidinnada daartu allabariga dadka
ku karin doonaan.

47 Oo haddana wuxuu mar kale i geeyey daarta
albaabkeedii, oo bal eeg, biyaa ka soo hoos baxayay
marinkii daarta dhankeeda bari, waayo, daarta horteedu
waxay u sii jeedday xagga bari, oo biyuhuna waxay ka soo
hoos baxayeen daarta dhankeeda midigta oo ah meesha

allabariga dhinaceeda koonfureed. 2 Markaasuu jidkii iridda
xagga woqooyi iga soo bixiyey, oo wuxuu ila wareejiyey
jidkii dibadda ahaa oo iridda dibadda loo mari jiray oo ku
dhinac yiil jidkii xagga bari u sii jeeday, oo bal eeg, biyaa
dhankeeda midigta ka dareerayay. 3 Oo ninkii markuu
xagga bari tegey isagoo gacanta xadhigga ku haysta wuxuu
qiyaasay kun dhudhun, oo wuxuu i soo dhex mariyey biyihii
oo anqowyada i jooga. 4 Oo haddana kun dhudhun ayuu
qiyaasay oo biyuhuu i soo dhex mariyey, oo biyuhu waxay i
joogeen lowyaha. Oo haddana kun dhudhun ayuu qiyaasay,
oo biyuhuu i soo dhex mariyey, oo markanna biyuhu waxay i
joogeen dhexda. 5 Oo haddana kun dhudhun ayuu qiyaasay,
oo markan waxay ahaayeen webi aanan lug kaga gudbi
karin, waayo, biyihii kor bay u keceen, oo waxay noqdeen
biyo lagu dabaasho iyo webi aan lug lagaga gudbi karin. 6
Oo wuxuu igu yidhi, Wiilka Aadamow, waxan ma aragtay? Oo
haddana wuu i soo waday oo wuxuu igu soo celiyey webiga
qarkiisii. 7 Haddaba markaan soo noqday, bal eeg, webiga
qarkiisii waxaa ku yiil geedo tiro badan oo dhankan iyo
dhankaasba kaga yaal. 8 Oo markaasuu igu yidhi, Biyahanu
waxay u baxayaan xagga dalka bari, oo waxay u dhacayaan
tan iyo lamadegaanka Caraabaah la yidhaahdo, iyo xagga
badda, biyihii baxayayna badday gelayaan oo biyuhuna
way bogsan doonaan. 9 Oo meel alla meeshuu webigaasu
gaadhoba wax kasta oo nool oo dhaqdhaqaaqaaba way
noolaan doonaan, oo waxaa jiri doona kalluun aad iyo
aad u faro badan, maxaa yeelay, biyahaasu halkaasay
u tagaan inay biyaha baddu bogsadaan aawadeed iyo
in wax kastaaba ay soo noolaadaan meel alla meeshuu
webigaasu gaadhoba. 10 Oo kalluumaystayaashuna waxay
istaagi doonaan badda qarkeeda, oo tan iyo Ceyn Gedii
iyo ilaa Ceyn Ceglayim inta ka dhex leh waxay ahaan
doontaa meel shabagyo lagu wadho, oo kalluunkooduna
wuxuu ahaan doonaa cayn badan oo sida kalluunka badda
weyn aad iyo aad u tiro badan. 11 Laakiinse meelaheeda
dhoobada iyo biyagaleenka ahuba ma ay bogsan doonaan,
illowse waxay ahaan doonaan cusbo miidhan. 12 Oo webiga
qarkiisana dhinacan iyo dhinacaasba waxaa ka bixi doona
geed kasta oo la cuno, oo aan caleentiisu dhari doonin, oo
aan midhihiisu dhammaan doonin. Oo bil kastaba wuxuu
soo bixin doonaa midho cusub, maxaa yeelay, biyahoodu
waxay ka soo baxaan meesha quduuska ah. Oo midhahoodu
waxay ahaan doonaan cunto, caleentooduna dawo. 13
Sayidka Rabbiga ahu wuxuu leeyahay, Tanu waa inay
ahaataa soohdinta aad dalka dhaxal ahaan ugu qaybsan
doontaan siday laba iyo tobanka qabiil oo reer binu Israa'iil
yihiin. Reer Yuusuf waa inuu laba qaybood helaa. 14 Oo
waa inaad dhaxashaan, oo intii midkiin helo waa in kan
kalena uu intaas oo kale helaa, waayo, gacantaydaan kor
ugu qaaday oo ku dhaartay inaan awowayaashiin siinayo,
oo dalkaasu dhaxal buu idiin ahaan doonaa. 15 Oo dalka
soohdintiisa dhanka woqooyi waxay ahaan doontaa tan
iyo badda weyn iyo jidka Xetlon iyo ilaa meesha laga galo
Sedaad, 16 iyo Xamaad, iyo Beerotaah, iyo Sibrayim oo u
dhaxaysa soohdinta Dimishaq iyo soohdinta Xamaad, iyo
Xasar Hatiikoon oo ku ag taal soohdinta Xawraan. 17 Oo
soohdinta tan iyo badduna waxay ahaan doontaa Xasar
Eenaan oo ah soohdinta Dimishaq, oo xagga woqooyina waa
soohdinta Xamaad. Taasu waa soohdinta dhanka woqooyi.
18 Oo tan dhanka barina waxay ahaan doontaa Webi Urdun
oo u dhexeeya Xawraan iyo Dimishaq iyo Gilecaad, iyo
dalka reer binu Israa'iil. Tan iyo soohdintaas iyo ilaa badda
bari waa inaad qiyaastaan, oo taasuna waa tan dhanka bari.
19 Oo dhanka koonfureed xaggiisana waa tan iyo Taamaar
iyo ilaa biyaha Meriibad Qaadeesh, iyo tan iyo webiga
xagga badda weyn, oo taasuna waa soohdinta dhanka
koonfureed. 20 Oo tan dhanka galbeedna waxay ahaan
doontaa badda weyn ilaa soohdinta koonfureed iyo ilaa la
yimaado meel Xamaad ka soo hor jeedda. Oo taasuna waa
soohdinta dhanka galbeed. 21 Sidaas waa inaad dalkaas u
qaybsataan siday qabiilooyinka reer binu Israa'iil yihiin. 22 Oo
waa inaad dhaxal ahaan saami ugu qaybsataan idinka iyo
shisheeyayaasha idin dhex deggan oo dhexdiinna carruurta
ku dhalay, oo waxay idiin ahaan doonaan sida kuwa dalka
ku dhex dhashay oo reer binu Israa'iil oo kale, oo iyaguna
waa inay dhaxal idinkula qaataan qabiilooyinka reer binu
Israa'iil dhexdooda. 23 Oo Sayidka Rabbiga ahu wuxuu
leeyahay, Kan shisheeyaha ahu qabiilkii uu dhex deggan
yahay halkaas waa inaad dhaxalkiisa kala siisaan.

48 Haddana kuwanu waa magacyadii qabiilooyinka. Xagga
woqooyi tan iyo jidka Xetlon agtiisa iyo ilaa meesha
Xamaad laga galo, iyo Xasar Eenaan iyo ilaa soohdinta
Dimishaq xaggeeda woqooyi iyo ilaa xagga Xamaad, kuwaas
oo ah dhinacyada bari iyo galbeed, waxaa jiri doonta qaybta
reer Daan. 2 Oo waxaa soohdinta reer Daan dhankeeda
bari iyo ilaa dhankeeda galbeed ku xigi doonta qaybta reer
Aasheer. 3 Oo waxaa soohdinta reer Aasheer dhankeeda
bari iyo ilaa dhankeeda galbeed ku xigi doonta qaybta reer
Naftaali. 4 Oo waxaa soohdinta reer Naftaali dhankeeda
bari iyo ilaa dhankeeda galbeed ku xigi doonta qaybta reer
Manaseh. 5 Oo waxaa soohdinta reer Manaseh dhankeeda
bari iyo ilaa dhankeeda galbeed ku xigi doonta qaybta reer
Efrayim. 6 Oo waxaa soohdinta reer Efrayim dhankeeda

bari iyo ilaa dhankeeda galbeed ku xigi doonta qaybta reer
Ruubeen. 7 Oo waxaa soohdinta reer Ruubeen dhankeeda
bari iyo ilaa dhankeeda galbeed ku xigi doonta qaybta
reer Yahuudah. 8 Oo soohdinta reer Yahuudah dhankeeda
bari iyo ilaa dhankeeda galbeedna waxaa ku xigi doonta
meeshaad qurbaan ahaan u bixinaysaan oo ballaadhkeedu
yahay shan iyo labaatan kun oo cawsduur, oo dhererkeeduna
ula mid yahay sida qaybaha kale middood tan iyo dhankeeda
bari iyo ilaa dhankeeda galbeed inta ka dhex leh, oo
meesha quduuska ahuna waxay ku oolli doontaa meeshaas
dhexdeeda. 9 Oo meesha aad Rabbiga qurbaan ahaan
ugu bixinaysaan dhererkeedu waa inuu ahaadaa shan iyo
labaatan kun oo cawsduur, oo ballaadhkeeduna toban kun.
10 Oo meeshaas ah qurbaanka quduuska ah waxaa iska
lahaan doona wadaaddada. Dhankeeda woqooyi dhererkiisu
waa inuu ahaadaa shan iyo labaatan kun, oo dhankeeda
galbeed ballaadhkiisuna toban kun, oo dhankeeda bari
ballaadhkiisuna toban kun, oo dhankeeda koonfureed
dhererkiisuna shan iyo labaatan kun, oo meesha quduuska
ah ee Rabbiguna waa inay dhexdeeda ku taallaa. 11 Oo
meeshaas waxaa iska lahaan doona wadaaddada quduuska
laga dhigay ee reer Saadooq oo adeegiddaydii xajiyey oo
aan u baadiyoobin sidii ay reer Laawi u baadiyoobeen
markay reer Israa'iil baadiyoobeen. 12 Oo meeshaasu waxay
iyaga u ahaan doontaa dal qurbaan ah oo ka mid ah dhulka
qurbaan ahaan loo bixiyey, oo soohdinta reer Laawi ku
xigta. 13 Oo meel soohdinta wadaaddada ku xigtana waxay
reer Laawi ku lahaan doonaan dhul dhererkiisu yahay shan
iyo labaatan kun oo cawsduur, oo ballaadhkiisuna yahay
toban kun, oo dhererka oo dhammu waa inuu ahaadaa
shan iyo labaatan kun, oo ballaadhkuna waa inuu ahaadaa
toban kun. 14 Oo iyagu waa inayan innaba iibsan, ama
ayan beddelan, ama ayan dalka midhihiisa hore innaba
shisheeye u gudbin, waayo, dhulkaasu Rabbiguu quduus u
yahay. 15 Oo shanta kun oo ka hadhay ballaadhka ah shan
iyo labaatanka kun waxay ahaan doontaa meel dadka ka
dhexaysa oo ah magaalada la dego iyo agagaarkeeda, oo
magaaladuna waa inay ku dhex taallaa. 16 Oo kuwanuna
waa inay qiyaasteeda ahaadaan: dhanka woqooyi waa inuu
ahaadaa afar kun iyo shan boqol, dhanka koonfureedna afar
kun iyo shan boqol, dhanka barina afar kun iyo shan boqol,
dhanka galbeedna afar kun iyo shan boqol. 17 Oo magaalada
agagaarkeeduna xagga woqooyi waa inuu ahaadaa laba
boqol iyo konton, xagga koonfureedna laba boqol iyo konton,
xagga barina laba boqol iyo konton, xagga galbeedna laba
boqol iyo konton. 18 Oo dhererka ka hadhay oo ku xiga dalka
qurbaanka ee quduuska ah dhankiisa bari waa inuu ahaadaa
toban kun, oo dhankiisa galbeedna waa inuu ahaadaa toban
kun, oo waa inuu ku xigaa dalka qurbaanka ee quduuska
ah; oo waxa dhulkaas ka baxaana cunto bay u ahaan
doonaan kuwa magaalada ku hawshooda. 19 Oo dhulkaas
waxaa beeri doona kuwa magaalada ku hawshooda ee
qabiilooyinka reer binu Israa'iil ka soo baxa oo dhan. 20 Oo
dhulka qurbaanka ah oo dhammu waa inuu ahaadaa shan
iyo labaatan kun oo dherer ah iyo shan iyo labaatan kun
oo ballaadh ah. Dalka qurbaanka ee quduuska ah oo aad
bixinaysaan waa inuu ahaadaa afar gees iyadoo hantida
magaaladu ku taal. 21 Oo inta hadhana waxaa iska lahaan
doona amiirka, dhinacan iyo dhinacaas oo dalka qurbaanka
ee quduuska ah, iyo meesha ay magaaladu ku taalloba,
oo ka soo hor jeedda shan iyo labaatanka kun oo dalka
qurbaanka ah oo xagga soohdinta bari, iyo dhanka galbeed
oo ka soo hor jeeda shan iyo labaatanka kun oo xagga
soohdinta galbeed, oo ku xiga qaybaha. Oo intaas waxaa
lahaan doona amiirka, oo dalka qurbaanka ee quduuska ah
iyo meesha quduuska ah ee daartana waa inay ku dhex
yaallaan. 22 Oo weliba xagga hantida reer Laawi iyo xagga
hantida magaalada oo ku dhex yaal meesha amiirka oo
u dhaxaysa soohdinta reer Yahuudah iyo soohdinta reer
Benyaamiinba waxaa iska lahaan doona amiirka. 23 Oo
qabiilooyinka kale oo hadhana tan iyo dhanka bari iyo ilaa
dhanka galbeed reer Benyaamiin waa inay qayb ka helaan.
24 Oo waxaa soohdinta reer Benyaamiin dhankeeda bari iyo
ilaa dhankeeda galbeed ku xigi doonta qaybta reer Simecoon.
25 Oo waxaa soohdinta reer Simecoon dhankeeda bari iyo
ilaa dhankeeda galbeed ku xigi doonta qaybta reer Isaakaar.
26 Oo waxaa soohdinta reer Isaakaar dhankeeda bari iyo
ilaa dhankeeda galbeed ku xigi doonta qaybta reer Sebulun.
27 Oo waxaa soohdinta reer Sebulun dhankeeda bari iyo ilaa
dhankeeda galbeed ku xigi doonta qaybta reer Gaad. 28
Oo xagga soohdinta reer Gaadna dhankeeda koonfureed
soohdintu waa inay ahaataa tan iyo Taamaar iyo ilaa biyaha
Meriibad Qaadeesh, iyo tan iyo webiga xagga badda weyn.
29 Kaasu waa dalka aad qabiilooyinka reer binu Israa'iil
dhaxal ahaan saami ugu qaybin doontaan, oo intaasuna
waa qaybahooda, ayaa Sayidka Rabbiga ahu leeyahay. 30
Oo kuwanuna waa meelaha magaalada laga baxo, xagga
dhanka woqooyi waa afar kun iyo shan boqol oo cawsduur.
31 Oo magaalada irdaheedana waa in lagu magacaabaa
qabiilooyinka reer binu Israa'iil magacyadooda. Saddexda
irdood oo xagga woqooyi irid waa in reer Ruubeen lagu
magacaabaa, iridna reer Yahuudah, iridna reer Laawi. 32
Oo xagga dhanka barina waa afar kun iyo shan boqol oo
cawsduur, oo saddexda irdood oo xagga barina irid waa in

reer Yuusuf lagu magacaabaa, iridna reer Benyaamiin, iridna
reer Daan. **33** Oo xagga dhanka koonfureedna qiyaastiisu
waa afar kun iyo shan boqol oo cawsduur, oo saddexda
irdood oo dhanka koonfureed irid waa in reer Simecoon lagu
magacaabaa, iridna reer Isaakaar, iridna reer Sebulun. **34**
Oo xagga dhanka galbeedna waa afar kun iyo shan boqol
oo cawsduur, oo saddex irdood leh, oo irid waa in reer Gaad
lagu magacaabaa, iridna reer Aasheer, iridna reer Naftaali.
**35** Oo magaalada wareeggeeduna wuxuu ahaan doonaa
siddeed iyo toban kun oo cawsduur, oo maalintaas intii laga
bilaabona magaalada magaceedu wuxuu ahaan doonaa,
Rabbigaa halkaas jooga.

# Daanyeel

1 Sannaddii saddexaad oo boqornimadii boqorkii Yahuudah
oo ahaa Yehooyaaqiim waxaa Yeruusaalem yimid oo
hareereeyey boqorkii Baabuloon oo ahaa Nebukadnesar.
2 Sayidkuna gacantiisuu geliyey boqorkii Yahuudah oo
ahaa Yehooyaaqiim iyo weelashii guriga Ilaah qaarkood,
markaasuu u qaaday waddanka la yidhaahdo Shincaar, iyo
gurigii ilaahiisa; oo weelashiina wuxuu geliyey gurigii ilaahiisa
khasnadda u ahaa. 3 Markaasaa boqorkii la hadlay Ashfenas
oo madax u ahaa raggiisii bohommada ahaa, oo wuxuu u
sheegay inuu keeno reer binu Israa'iil qaar ka mid ah, oo
weliba ah kuwo ka soo farcamay reer boqor, iyo kuwa gobta
ah; 4 kuwo dhallinyar oo aan iin lahayn, oo qurqurxoon, oo
xagga xigmadda oo dhan ku dheer, oo aqoon badan, oo
waxgarasho leh, iyo inta awood u leh inay guriga boqorka
istaagaan, iyo inuu iyaga tacliinta iyo afka reer Kaldayiin
baro. 5 Boqorkiina wuxuu rukun uga dhigay iyagii in ka mid
ah cuntadiisii wanaagsanayd iyo khamrigii uu cabbi jiray,
oo wuxuu amray in intii saddex sannadood ah la quudiyo
si ay dabadeed boqorka isu hor taagaan. 6 Kuwaasna
waxaa ku jiray, oo reer Yahuudah ka mid ahaa, Daanyeel,
Xananyaah, Miishaa'eel, iyo Casaryaah. 7 Markaasaa
amiirkii bohommada ayaa magacyo u baxshay oo Daanyeel
wuxuu u baxshay Beelteshaasar, Xananyaahna wuxuu u
baxshay Shadrag; Miishaa'eelna wuxuu u baxshay Meeshag;
Casaryaahna wuxuu u baxshay Cabeednegoo. 8 Daanyeelna
wuxuu qalbiga ku haystay inuusan isku nijaasayn cuntada
wanaagsan ee boqorka iyo khamriga uu cabbo toona;
sidaas daraaddeed wuxuu amiirkii bohommada weyddiistay
inuu u oggolaado inuusan isnijaasayn. 9 Haddaba Ilaah
wuxuu ka dhigay in Daanyeel raallinimo iyo raxmad ka helo
amiirkii bohommada. 10 Markaasaa amiirkii bohommadu
Daanyeel ku yidhi, Waxaan ka cabsanayaa sayidkayga
boqorka ah, oo rukunka idiinka dhigay cuntadiinna iyo
cabbitinkiinna, waayo, muxuu u arki wejiyadiinna oo ka liita
kuwa dhallinyarada ah ee aad isku da'da tihiin? Sidaasaad
madaxayga khatar ugu gelinaysaan boqorka hortiisa. 11
Markaasaa Daanyeel ku yidhi wakiilkii, amiirka bohommadu
ka dhigay inuu u taliyo Daanyeel, iyo Xananyaah, iyo
Miishaa'eel, iyo Casaryaah, 12 Waan ku baryayaaye, intii
toban maalmood ah na tijaabi annagoo addoommadaada
ah, oo ha nala siiyo atar aan cunno iyo biyo aan cabnoba.
13 Dabadeedna wejiyadayada hortaada ha lagu fiiriyo iyo
wejiga dhallinyarada boqorka cuntadiisa cunta; oo markaas
annagoo ah addoommadaada sidii aad nagu aragtid noola
macaamilo. 14 Sidaasuu uga dhegaystay xaaladdaas, oo
intii toban maalmood ah ayuu tijaabiyey. 15 Markay tobankii
maalmood dhammaadeen, way ka weji qurxoonaayeen,
wayna ka buurbuurnaayeen dhallinyaradii cuntada boqorka
wax ka cuni jirtay oo dhan. 16 Sidaas daraaddeed wakiilkii
waa ka qaaday cuntadoodii iyo khamrigii ay cabbi jireen, oo
wuxuu siiyey atar. 17 Haddaba afartaas nin oo dhallinyarada
ahaa Ilaah wuxuu siiyey aqoon, iyo inay tacliin iyo xigmad
oo dhan ku dheeraadaan; Daanyeelna wuxuu garan jiray
waxyaalo la tuso iyo riyooyin oo dhan. 18 Oo markii
wakhtigii boqorku yidhi, Ha la ii keeno, dhammaaday ayuu
amiirkii bohommadu keenay iyagii Nebukadnesar hortiisa.
19 Boqorkiina markaasuu la hadlay iyagii, oo kulligoodna
lagama helin mid la mid ah Daanyeel, iyo Xananyaah, iyo
Miishaa'eel, iyo Casaryaah; sidaas daraaddeed boqorkii bay
is-hor taageen. 20 Waxyaalihii boqorku weyddiiyey oo ku
saabsan xigmadda iyo waxgarashada, wuxuu ogaaday inay
toban jeer kaga fiican yihiin saaxiriintii iyo xiddigiyayaashii
boqortooyadiisa joogay oo dhan. 21 Daanyeelna waa sii
joogay tan iyo boqorkii Kuuros sannaddiisii kowaad.

2 Oo sannaddii labaad oo boqornimadii Nebukadnesar
ayaa Nebukadnesar riyooyin ku riyooday, markaasuu
argaggaxay oo ay hurdadiisii ka baabba'day. 2 Markaasaa
boqorkii wuxuu ku amray in loo yeedho saaxiriintii, iyo
xiddigiyayaashii iyo falalowyadii, iyo kuwii reer Kaldayiin
ahaa, inay boqorka u sheegaan riyooyinkiisii. Markaasay
soo galeen oo boqorkii hortiisa istaageen. 3 Markaasaa
boqorkii wuxuu ku yidhi, Riyaan ku riyooday, waxaanan la
argaggaxsanahay inaan ogaado waxa riyada micneheedu
yahay. 4 Markaasaa kuwii reer Kaldayiin ahaa boqorkii
kula hadleen afkii reer Suuriya, waxayna ku yidhaahdeen,
Boqorow, weligaaba noolow. Bal riyadaada noo sheeg
annagoo addoommadaada ah oo annana waxaannu kuu
caddayn doonnaa fasirkeeda. 5 Boqorkii waa u jawaabay,
oo wuxuu ku yidhi kuwii reer Kaldayiin ahaa, Wixii waa iga
tegey, oo haddaydnan ii caddayn riyadii iyo fasirkeediiba,
waa laydin googooyn doonaa, guryahiinnana waxaa laga
dhigi doonaa meel digo lagu tuulo. 6 Laakiinse haddaad
ii caddaysaan riyadii iyo fasirkeediiba, waxaan idin siin
doonaa hadiyad iyo abaalgud iyo ciso weyn; haddaba sidaas
daraaddeed ii caddeeya riyadii iyo fasirkeediiba. 7 Iyana mar
labaad bay u jawaabeen oo waxay yidhaahdeen, Boqorow,
annagoo ah addoommadaada, riyadii noo sheeg, oo annana
waxaannu caddayn doonnaa fasirkeedii. 8 Boqorkiina waa
jawaabay oo wuxuu yidhi, Xaqiiqa waan garanayaa inaad
wakhti dheer qaadanaysaan, maxaa yeelay, waad og tihiin in
wixii iga tegey. 9 Laakiinse haddaydnan riyadii ii caddayn,

de markaas sharci keliya ayaad leedihiin, waayo, waxaad
soo diyaarsateen hadal been ah oo kharriban inaad igula
hadashaan ilaa uu wakhtigu beddelmo. Haddaba riyadii ii
sheega, dabadeedna waan ogaan doonaa inaad fasirkeediina
ii caddayn kartaan. 10 Kuwii reer Kaldayiin ahaana boqorkii
bay u jawaabeen, oo waxay ku yidhaahdeen, Dhulka ma
joogo nin caddayn karaa xaalkaaga, boqorow; waayo, lama
arag boqor, ama sayid, ama taliye waxan oo kale weyddiiyey
saaxir ama xiddigiye, ama mid ka mid ah reer Kaldayiin toona.
11 Waxaad weyddiisay, boqorow, waa wax aan badanaa la
weyddiin dadka, qof kale oo boqorka u caddayn karaana ma
jiro ilaahyada mooyaane, kuwaasoo aan hoygoodu binu-
aadmiga la jirin. 12 Sababtaas daraaddeed ayaa boqorkii
cadhooday oo aad buu u dhirfay, oo wuxuu amray in la
baabbi'iyo raggii Baabuloon oo xigmadda lahaa oo dhan. 13
Amarkiina waa baxay, nimankii xigmadda lahaana waxaa la
doonayay in la wada laayo, markaasay dooneen Daanyeel
iyo saaxiibbadiis in la laayo. 14 Daanyeelna jawaab buu talo
iyo miyir ugu celiyey Aryoog oo ahaa sirkaalkii waardiyaha
boqorka, oo u soo baxay inuu laayo raggii xigmadda
lahaa oo Baabuloon oo dhan. 15 Wuxuu Aryoog oo ahaa
sirkaalkii boqorka ugu jawaabay, Boqorku muxuu amarka ugu
degdegay? Markaasaa Aryoog xaalkii ogeysiiyey Daanyeel.
16 Markaasaa Daanyeel u galay, oo boqorkii weyddiistay
inuu u qabto wakhti uu boqorka ugu caddeeyo riyada
fasirkeedii. 17 Markaasaa Daanyeel gurigiisii tegey, oo xaalkii
ogeysiiyey Xananyaah, iyo Miishaa'eel, iyo Casaryaah, oo
ahaa saaxiibbadiis, 18 inay Ilaaha samada weyddiistaan
naxariis ku saabsan qarsoodigan, oo ayan Daanyeel iyo
saaxiibbadiis la baabbi'in raggii Baabuloon oo xigmadda
lahaa intoodii kale. 19 Markaasaa qarsoodigii Daanyeel
tusniin loogu muujiyey goor habeen ah. Daanyeelna Ilaaha
samada ayuu u mahadnaqay. 20 Daanyeelna waa jawaabay
oo wuxuu yidhi, Ammaan waxaa leh magaca Ilaah weligiis
iyo weligiis; waayo, isagaa leh xigmad iyo xoogba; 21 oo
wakhtiyada iyo xilliyadana isagaa kala bedbeddela; isagaa
boqorro dejiya oo boqorro saara. Xigmad buu siiyaa kuwa
xigmadda leh, aqoonna wuu siiyaa kuwa wax garta. 22 Wuu
muujiyaa waxyaalaha fog iyo qarsoodigaba; wuuna yaqaan
waxa gudcurka ku jira, nuurkuna isaguu la joogaa. 23 Waan
kugu mahadnaqayaa, oo waan ku ammaanayaa, Ilaaha
awowayaashayow, oo i siiyey xigmad iyo xoog, oo haatan i
ogeysiiyey wixii aannu kaa doonaynay; waayo, waad na
ogeysiisay xaalkii boqorka. 24 Sidaas daraaddeed Daanyeel
wuxuu u galay Aryoog, oo boqorku u doortay inuu baabbi'iyo
raggii xigmadda lahaa oo Baabuloon. Bal i gee boqorka
hortiisa, oo anna waxaan boqorka u caddayn doonaa fasirkii
riyada. 25 Markaasaa Aryoog haddiiba Daanyeel boqorka u
soo geliyey oo wuxuu ku yidhi, Maxaabiistii reer Yahuudah
ayaan ka helay nin ku ogeysiin doona fasirkii riyadaada,
boqorow. 26 Markaasaa boqorkii u jawaabay oo ku yidhi
Daanyeel, oo magiciisa la odhan jiray Beelteshaasar, Ma
i ogeysiin kartaa riyadii aan arkay iyo fasirkeediiba? 27
Daanyeelna waa jawaabay isagoo boqorkii hor taagan, oo
wuxuu yidhi, Qarsoodigii aad weyddiisay, boqorow, kuuma
caddayn karaan rag xigmad lahu, ama xiddigiyayaal, ama
saaxiriin, ama kuwa wax sii sheega toona; 28 laakiinse
samada waxaa jooga Ilaah muujiya waxyaalaha qarsoon, oo
isagu wuxuu ku ogeysiiyey, boqor Nebukadnesarow, waxa
jiri doona ugu dambaysta. 29 Riyadaadii iyo waxyaalihii
lagu tusay adoo sariirtaada ku jiifa waa kuwan: Boqorow,
sariirtaada ayaad ku dul fikirtay, oo waxaad istidhi, Maxaa
dhici doona hadda ka dib? Oo kan waxyaalo qarsoon
muujiyaa wuxuu ku ogeysiiyey waxa dhici doona. 30
Laakiinse aniga qarsoodigan la iiguma muujin xigmad aan
dheerahay dad kale oo nool, laakiinse sababtu waa in lagu
ogeysiiyo fasirkii riyadaada, boqorow, iyo inaad ogaatid
fikirrada qalbigaaga. 31 Boqorow, waxaad aragtay ekaan
weyn. Ekaantan xoogga weynayd, oo dhalaalkeedu aad u
wanaagsanaa, hortaaday istaagtay; soojeedkeeduna wuxuu
ahaa mid laga cabsado. 32 Ekaantaasna madaxeedu wuxuu
ahaa dahab wanaagsan, laabteeda iyo gacmaheeduna
waxay ahaayeen lacag, caloosheeda iyo bowdooyinkeeduna
waxay ahaayeen naxaas. 33 Lugaheeduna waxay ahaayeen
bir, cagaheeda qaar wuxuu ahaa bir, qaarna wuxuu ahaa
dhoobo. 34 Oo waxaad aragtay ilaa uu dhagax aan gacmo
lagu gooyn ekaantii kaga dhacay cagihii ahaa birta iyo
dhoobada, wayna kala burbureen. 35 Markaasaa birtii, iyo
dhoobadii, iyo naxaastii, iyo lacagtii, iyo dahabkiiba wada
burbureen, oo waxay noqdeen sida buunshaha meelaha
wax lagu tumo; dabayl baana la tagtay, si aan meella loogu
helin; markaasaa dhagaxii ekaanta ku dhacay wuxuu noqday
buur weyn, oo dhulka oo dhan buuxiyey. 36 Riyadii waa
tan, fasirkiina annagaa ku sheegi doonna boqorka hortiisa.
37 Adigu, Boqorow, waxaad tahay boqorkii boqorrada, oo
Ilaaha samadu siiyey boqortooyada, iyo xoogga, iyo itaalka
iyo ammaanta. 38 Oo meel kasta oo binu-aadmigu joogo,
dugaagga duurka, iyo haadka samadaba gacantuu kuu
geliyey, wuxuuna ka dhigay inaad xukunto kulligood; adigu
madaxii dahabka ahaa baad tahay. 39 Oo waxaa adiga
dabadaa kici doona boqortooyo kaa xoog yar, iyo boqortooyo
kale oo saddexaad oo naxaas ah oo dhulka oo dhan
xukumi doonta. 40 Oo boqortooyada afraadna waxay u xoog
badnaan doontaa sida birta; waayo, birtu way jejebisaa,

wayna ka adkaataa wax walba; oo sida birtu u burburiso
kuwan oo dhan ayay u jejebin oo ay u burburin doontaa.
41 Oo sidaad u aragtay cagaha iyo faraha lugeed oo qaar
yahay dhoobadii dheryasameeyaha, qaarna yahay birta,
ayay u noqon doontaa boqortooyo kala qaybsan, laakiinse
waxaa ku jiri doona xooggii birta, sidaad u aragtay birta
ku qasan dhoobada dheryaha laga sameeyo. 42 Oo sidii
faraha cagaha qaarkood bir u ahaa, qaarna dhoobo u ahaa,
ayaa boqortooyada qaarkeedna u xoog badnaan doonaa,
qaarkeedna u jabi doonaa. 43 Oo sidaad u aragtay dhoobada
dheryaha laga sameeyo iyo birta isku qasan, ayay isugu qasi
doonaan farcanka dadka; laakiinse isma ay qabsan doonaan,
sida aanay birtu ugu qasmi karin dhoobada. 44 Oo wakhtiga
boqorradaas ayaa Ilaaha samadu dhisi doonaa boqortooyo
aan weligeed la baabbi'inayn, ama dowladnimadeedu aanay
dad kale uga wareegayn, laakiinse way jejebin doontaa oo
baabbi'in doontaa boqortooyooyinkaas oo dhan, markaasay
weligeed taagnaan doontaa. 45 Waayo, waxaad aragtay
dhagax buurta laga soo gooyay oo aan gacmo lagu gooyn,
oo kala jejebiyey birtii, iyo naxaastii, iyo dhoobadii, iyo
lacagtii, iyo dahabkii; Ilaaha weynu wuxuu, boqorow, ku
ogeysiiyey waxa dhici doona hadda dabadeed, riyaduna waa
dhab, fasirkeeduna waa wax la hubo. 46 Markaasaa boqorkii
ahaa Nebukadnesar wejigiisa u dhacay, oo u sujuuday
Daanyeel, oo wuxuu amray inay u bixiyaan qurbaan iyo foox
udgoon. 47 Boqorkiina waa u jawaabay Daanyeel oo wuxuu
ku yidhi, Sida runta ah Ilaahaagu waa Ilaaha ilaahyada iyo
Sayidka boqorrada, iyo mid muujiya waxyaalo qarsoon,
maxaa yeelay, waxaad awoodday inaad daaha ka qaaddid
qarsoodigan. 48 Markaasaa boqorkii Daanyeel derejeeyey,
oo wuxuu siiyey hadiyado badan oo waaweyn, wuuna u
dhiibay taladii gobolkii Baabuloon oo dhan, oo wuxuu ka
dhigay taliyaha madaxda u ah ragga xigmadda leh oo
Baabuloon oo dhan. 49 Daanyeelna boqorkuu weyddiistay
inuu ka dhigo Shadrag, iyo Meeshag, iyo Cabeednegoo inay
axwaalkii gobolkii Baabuloon u taliyaan, Daanyeelse wuxuu
joogay iridda boqorka.

3 Boqor Nebukadnesar wuxuu sameeyey ekaan dahab ah,
oo jooggeedu lixdan dhudhun yahay, ballaadhkeeduna lix
dhudhun yahay, oo wuxuu qotomiyey bannaankii Duuraa
oo ku yaal gobolka Baabuloon. 2 Markaasaa Boqor
Nebukadnesar wuxuu cid u diray amiirradii, iyo taliyayaashii,
iyo saraakiishii, iyo xaakinnadii, iyo khasnajiyadii, iyo
waaniyayaashii, iyo madaxdii boliiska, iyo kuwii gobollada
xukumay oo dhan, inay u yimaadaan furitaanka ekaanta uu
Boqor Nebukadnesar qotomiyey. 3 Markaasaa amiirradii,
iyo taliyayaashii, iyo saraakiishii, iyo xaakinnadii, iyo
khasnajiyadii, iyo waaniyayaashii, iyo madaxdii boliiska, iyo
kuwii gobollada xukumi jiray oo dhammu u wada yimaadeen
furitaankii ekaantii Boqor Nebukadnesar qotomiyey, oo
waxay hor istaageen ekaantii uu Nebukadnesar qotomiyey. 4
Markaasaa naadiye aad u dhawaaqay, oo yidhi, Dadyowga,
iyo quruumaha, iyo kuwa kala afka ahow, waxaa laydinku
amray, 5 in markii aad maqashaan codka buunka, iyo
biibiilaha, iyo kataaradda, iyo shareeradda, iyo kiraarka,
iyo cayn kasta oo muusiko ah, aad hoos u dhacdaan oo u
sujuuddaan ekaanta dahabka ah oo Boqor Nebukadnesar
qotomiyey, 6 oo mid kasta oo aan hoos u dhicin oo
aan u sujuudin, isla saacaddiiba waxaa lagu dhex tuuri
doonaa foorno dab ah oo ololaysa. 7 Haddaba markii
dadkii oo dhammu maqleen codkii buunka, iyo biibiilaha,
iyo kataaradda, iyo shareeradda, iyo kiraarka, iyo cayn
kasta oo muusiko ah ayaa dadyowgii, iyo quruumihii, iyo
kuwii kala afka ahaa oo dhammu hoos u dhaceen oo u
sujuudeen ekaantii dahabka ahayd oo Boqor Nebukadnesar
qotomiyey. 8 Haddaba wakhtigaas kuwo reer Kaldayiin ah
ayaa soo dhowaaday oo Yuhuuddii dacweeyey. 9 Oo intay
u jawaabeen bay ku yidhaahdeen Boqor Nebukadnesar,
Boqorow, weligaaba noolow. 10 Boqorow, amar baad ku
bixisay in nin kastaaba markuu maqlo codka buunka, iyo
biibiilaha, iyo kataaradda, iyo shareeradda, iyo kiraarka, iyo
cayn kasta oo muusiko ah, uu hoos u dhaco oo u sujuudo
ekaanta dahabka ah, 11 iyo in mid kasta oo aan hoos u
dhicin oo aan u sujuudin, lagu dhex tuuri doono foorno dab
ah oo ololaysa. 12 Waxaa jira kuwo Yuhuud ah oo aad
u dooratay inay axwaalkii gobolkii Baabuloon u taliyaan,
waana Shadrag, iyo Meeshag, iyo Cabeednegoo; haddaba,
Boqorow, nimankaasu dan kaama ay lahayn; iyagu uma
adeegaan ilaahyadaada, umana sujuudaan ekaanta dahabka
ah oo aad qotomisay. 13 Markaasaa Nebukadnesar intuu
dhirfay oo aad u cadhooday ayuu amray in la keeno Shadrag,
iyo Meeshag, iyo Cabeednegoo. Markaasay nimankan soo
hor taageen boqorkii. 14 Nebukadnesarna wuu u jawaabay
oo ku yidhi iyagii, Shadrag, iyo Meeshag, iyo Cabeednegoow,
Ma kas baad u yeesheen inaydnaan u adeegin ilaahayga
ama aydnaan u sujuudin ekaantayda dahabka ah oo aan
qotomiyey? 15 Haddaba haddaad diyaar tihiin in wakhtigii
aad maqashaan codka buunka, iyo biibiilaha, iyo kataaradda,
iyo shareeradda, iyo kiraarka, iyo cayn kasta oo muusiko ah,
aad hoos u dhacdaan oo aad u sujuuddaan ekaanta aan
sameeyey, hagaag, laakiinse haddaad u sujuudi weydaan,
waxaa isla saacaddiiba laydinku dhex tuuri doonaa foorno
dab ah oo ololaysa. Kolkaas waa ayo Ilaaha gacantayda
idinka badbaadin doonaa? 16 Markaasaa Shadrag, iyo

Meeshag, iyo Cabeednegoo u jawaabeen boqorkii, oo waxay
ku yidhaahdeen, Nebukadnesarow, annagu uma baahnin
inaannu kaaga jawaabno xaalkan. 17 Haddaba hadday
saas tahay, Ilaahayaga aannu u adeegnaa waa awoodaa
inuu naga samatabbixiyo foornada dabka ah oo ololaysa;
oo isagu waa naga samatabbixin doonaa gacantaada,
Boqorow. 18 Laakiinse haddaanay ahayn, Boqorow, haddaba
ogow, inaannan u adeegayn ilaahyadaada, ama aannan
u sujuudayn ekaanta dahabka ah oo aad qotomisay. 19
Markaasaa Nebukadnesar aad ugu cadhooday Shadrag, iyo
Meeshag, iyo Cabeednegoo, wejigiisiina waa beddelmay;
kolkaasuu hadlay oo wuxuu ku amray in foornada laga
sii kululeeyo toddoba jeer intii hore loo kululayn jiray. 20
Oo wuxuu ku amray niman xoog badan oo ciidankiisa
ku jiray inay xidhxidhaan Shadrag, iyo Meeshag, iyo
Cabeednegoo, oo ay ku dhex tuuraan foornada dabka ah
oo ololaysa. 21 Markaasaa nimankii la xidhxidhay iyagoo
qaba sirwaalladoodii, iyo khamiisyadoodii, iyo go'yaashoodii,
iyo dharkoodii kaleba, oo waxaa lagu dhex tuuray foornadii
dabka ahayd oo ololaysay. 22 Boqorka amarkiisu wuxuu
ahaa degdeg, foornaduna aad iyo aad bay u kululayd,
sidaas daraaddeed ololkii dabku wuxuu dilay nimankii waday
Shadrag, iyo Meeshag, iyo Cabeednegoo. 23 Saddexdii
nin ee ahaa Shadrag, iyo Meeshag, iyo Cabeednegoona
waxay iyagoo xidhxidhan ku dhex dheceen foornadii dabka
ahayd oo ololaysay. 24 Markaasaa Boqor Nebukadnesar
yaabay, oo haddiiba kacay; oo intuu hadlay ayuu ku yidhi
waaniyayaashiisii, Miyaynan saddex nin oo xidhxidhan dabka
ku dhex ridin? Markaasay u jawaabeen oo waxay boqorkii
ku yidhaahdeen, Taasu waa run, Boqorow. 25 Kolkaasuu
jawaabay oo yidhi, Bal eega, waxaan arkaa afar nin oo
furan, oo dabka ku dhex socda, ee aan waxyeello gaadhin;
oo midka afraad soojeedkiisu wuxuu u eg yahay mid ka
mid ah wiilasha ilaahyada. 26 Markaasaa Nebukadnesar
wuxuu ag yimid foornadii dabka ahayd oo ololaysay afkeedii,
oo intuu hadlay buu yidhi, Shadrag, iyo Meeshag, iyo
Cabeednegoow, Ilaaha ugu Sarreeya addoommadiisow,
soo baxa, oo halkan kaalaya. Markaasaa Shadrag, iyo
Meeshag, iyo Cabeednegoo dabkii ka soo dhex bexeen.
27 Markaasaa amiirradii, iyo taliyayaashii, iyo saraakiishii,
iyo boqorka waaniyayaashiisii, iyagoo isku urursan, waxay
arkeen inaanu dabku ka adkaan nimankaas jidhkooda, ama
aanu timahoodiina halow marin, ama aan sirwaalladoodii
beddelmin, ama aan dadka urtiisii gaadhin. 28 Markaasaa
Nebukadnesar hadlay oo wuxuu yidhi, Mahad waxaa leh
Ilaaha Shadrag, iyo Meeshag, iyo Cabeednegoo, oo u
soo diray malaa'igtiisa, oo badbaadiyey addoommadiisa
isaga isku halleeyey, oo beddelay hadalkii boqorka, oo
jidhkooda bixiyey, inayan u adeegin, ama u sujuudin ilaah
kale Ilaahooda mooyaane. 29 Sidaas daraaddeed waxaan
amar ku bixinayaa in dad kasta, iyo quruun kasta, iyo
kuwa kasta oo kala af ah, oo wax xun kaga hadla Ilaaha
Shadrag, iyo Meeshag, iyo Cabeednegoo, la googooyn
doono, guryahoodana laga dhigi doono meel digo lagu tuulo,
maxaa yeelay, ma jiro ilaah kale oo sidaas wax u badbaadin
karaa. 30 Markaasaa boqorkii Shadrag, iyo Meeshag, iyo
Cabeednegoo derejo sare ku siiyey gobolkii Baabuloon.

**4** Anoo Boqor Nebukadnesar ah waxaan ku leeyahay
dadyowga, iyo quruumaha, iyo kuwa kala afka ah oo
dhulka oo dhan deggan, Nabadu ha idinku badato. 2 Way ila
wanaagsanaatay inaan muujiyo calaamadihii iyo yaababkii
uu Ilaaha ugu sarreeyaa igu sameeyey. 3 Calaamadihiisu
waaweynaa! Yaababkiisuna xoog badanaa! Boqortooyadiisu
waa boqortooyo weligeed jiraysa, dowladnimadiisuna waa
mid jiraysa fac ilaa fac. 4 Anoo Nebukadnesar ah gurigaygaan
ku nasanayay, oo waxaan ku raaxaysanayay daartayda
weyn. 5 Waxaan arkay riyo iga cabsiisay, markaasaa
fikirradaydii aan sariirtayda la jiifay, iyo waxyaalihii lay tusay
iga argaggixiyeen. 6 Sidaas daraaddeed waxaan amar
ku bixiyey in hortayda la soo taago nimankii xigmadda
lahaa oo reer Baabuloon oo dhan, inay ii caddeeyaan
fasirkii riyada. 7 Dabadeedna waxaa ii yimid saaxiriintii,
iyo xiddigiyayaashii, iyo kuwii reer Kaldayiin, iyo kuwii wax
sheegi jiray; markaasaan riyadii ku hor sheegay; laakiinse
fasirkii iima ay caddayn. 8 Laakiinse ugu dambaystii waxaa
i hor yimid Daanyeel, oo la odhan jiray Beelteshaasar,
sida magaca ilaahay, oo ilaahyada quduuskaa ruuxoodu
ku jiro; markaasaan riyadii ku hor sheegay isagii, oo ku
idhi, 9 Beelteshaasarow, saaxiriinta madaxdoodiiyow, waan
ogahay in ilaahyada quduuskaa ruuxoodii kugu jiro, oo aan
qarsoodiina ku dhibin, ee haddaba ii sheeg waxyaalihii
aan ku arkay riyadaydii, iyo fasirkoodiiba. 10 Sidan bay
ahaayeen waxyaalihii aan arkay anigoo sariirtayda ku jiifa:
waxaan arkay geed dhulka ku dhex yaal, dhererkiisuna
waa weynaa. 11 Geedkii waa koray, wuuna xoog badnaa,
dhererkiisiina wuxuu gaadhay cirka, waxaana laga arkay
meesha dhulka ugu shishaysa. 12 Caleemihiisuna way
qurxoonaayeen, midhihiisuna way badnaayeen, waxaana ku
tiil cunto ku wada filan wax walba. Xayawaankii duurkuna
hoostiisay hadhsanayeen, haadka cirkuna waxay ku hoyan
jireen laamihiisa, oo wax jidh leh oo dhammuna isagay wax
ka cuni jireen. 13 Anoo sariirtayda jiifa waxaan ku arkay
waxyaalihii lay tusay, mid wax dhawra oo quduus ah oo

samada ka soo degay. **14** Markaasuu intuu aad u qayliyey
yidhi, Geedka gooya, laamihiisana ka jara, caleemihiisana ka
daadiya, midhihiisana kala firdhiyaa; xayawaanku hoostiisa
ha ka fogaadeen, haadkuna laamihiisa. **15** Habase yeeshee
jiridda iyo xididdadiisa dhulka ku dhex daaya, iyagoo ku
xidhan xadhig bir iyo naxaas ah, doogga jilicsan oo berrinka
dhexdiisa, oo dharabka samadu ha qoyo, oo qaybtiisuna ha la
jirto xayawaanka ku dhex jira doogga dhulka. **16** Qalbigiisuna
kan dadka ha ka beddelmo, qalbiga xayawaankana isaga
ha la siiyo; toddoba wakhtina ha gudbeen. **17** Xukunkii
waxaa amray kuwa wax dhawra xaalkuna wuxuu ku jiraa
hadalka kuwa quduuska ah, sababtu waa in waxa noolu
ogaadaan in Ka ugu Sarreeyaa u taliyo boqortooyada
dadka, oo uu siiyo ku alla kii uu doonayo, oo uu madax
uga dhigo kan dadka ugu hooseeya. **18** Anigoo ah Boqor
Nebukadnesar ayaan riyadan arkay, adna Beelteshaasarow,
fasirkeeda caddee, waayo, nimanka xigmadda leh ee
boqortooyadayda joogay oo dhammu way kari waayeen inay
fasirkii ii caddeeyaan; laakiinse adigu waad kartaa, waayo,
ruuxii ilaahyada quduuska ah ayaa kugu jira. **19** Markaasaa
Daanyeel oo magiciisu ahaa Beelteshaasar, ayaa inta wakhti
ah yaabbanaa, fikirradiisiina wuu la welwelay. Markaasaa
boqorkii u jawaabay oo ku yidhi, Beelteshaasarow, ha
ka welwelin riyada ama fasirkeeda. Beelteshaasarna waa
jawaabay oo yidhi, Sayidkaygiiyow, riyadu ha u noqoto kuwa
ku neceb, fasirkeeduna ha u noqdo cadaawayaashaada.
**20** Geedkii aad aragtay, oo koray, oo xoogga badnaa,
oo dhererkiisu cirka gaadhay, ee dhulka oo dhan laga
arkayay, **21** oo caleemihiisu qurxoonaayeen, midhihiisuna
badnaayeen, oo cuntada wax walba ku filanu ku tiil; oo
hoostiisa xayawaanka duurku hadhsanayeen, oo laamihiisa
haadka cirku rugta ka dhigtay, **22** waa adiga oo koray oo
xoog badan yeeshay Boqorow, waayo, weynaantaadii way
badatay oo cirka gaadhay dowladnimadaaduna meesha
dhulka ugu shishaysa. **23** Oo waxaad aragtay mid wax
dhawra oo quduus ah oo samada ka soo degaya, isagoo
leh, Geedka gooya, oo baabbi'iya; habase yeeshee jiridda
iyo xididdadiisa dhulka ku daaya, iyagoo ku xidhan xadhig
bir iyo naxaas ah, doogga jilicsan oo berrinka dhexdiisa,
oo dharabka samadu ha qoyo, qaybtiisuna ha la jirto
xayawaanka duurka, jeeray toddoba wakhti gudbaan, **24**
fasirkii waa kan, Boqorow, waana amarkii Ka ugu Sarreeya,
oo kugu soo degay adoo sayidkayga ah boqorow. **25** Dadka
waa lagaa fogayn doonaa, oo waxaad la joogi doontaa
xayawaanka duurka, oo sidii dibi ayaad doog u cuni doontaa,
oo waxaa ku qoyn doona dharabka samada, toddoba
wakhtina waa ku gudbi doonaan, jeeraad ogaato in Ka ugu
Sarreeyaa u taliyo boqortooyada dadka, oo uu siiyo ku alla
kii uu doonayo. **26** Oo sida loo amray in la daayo jiridda iyo
xididdada geedka, ayaa boqortooyadaadu hubaal ku noqon
doontaa, markaad ogaato inay samooyinku wax u taliyaan.
**27** Haddaba Boqorow, taladayda aqbal, dembiyadaadana
xaqnimo ku jebi, xumatooyinkaagana ku jebi naxariista aad
masaakiinta u naxariisatid si ay xasilloonaantaadu u sii
raagto. **28** Waxyaalahan oo dhammu waxay ku dheceen
Boqor Nebukadnesar. **29** Laba iyo toban bilood dabadoodna
wuxuu dhex socday gurigii boqornimada ee reer Baabuloon.
**30** Markaasaa boqorkii hadlay oo yidhi, Sow tanu ma aha
Baabuloontii weynayd, oo aan u dhisay meel boqornimadu
rug u leedahay, oo aan ammaanta weynaantayda ugu dhisay
xoogga itaalkayga? **31** Intii hadalkaasu weli boqorka afkiisii
ku jiray ayaa cod samada ka dhawaaqay, oo yidhi, Boqor
Nebukadnesarow, adaa lagula hadlayaa, boqortooyadii waa
kaa tagtay. **32** Oo dadka waa lagaa eryi doonaa, oo waxaad
la joogi doontaa xayawaanka duurka, oo waxaa lagaa dhigi
doonaa inaad doog u cunto sidii dibi, toddoba wakhtina way
ku gudbi doonaan, jeeraad ogaato in Ka ugu Sarreeyaa
u taliyo boqortooyada dadka, oo uu siiyo ku alla kii uu
doonayo. **33** Oo isla saacaddiiba waxyaalihii waa ku dheceen
Nebukadnesar; kolkaasaa dadkii laga eryay, sidii dibina doog
buu u cunay, jidhkiisiina waxaa qoyay dharabkii samada,
ilaa ay timihiisii u bexeen sida baalal gorgor, ciddiyihiisiina
sida ciddiyo haadeed. **34** Oo markii wakhtigii dhammaaday
ayaan anigoo ah Nebukadnesar indhaha kor u taagay,
waxgarashadaydiina way ii soo noqotay, markaasaan ku
mahadnaqay Ka ugu Sarreeya, waanan ammaanay oo
ciseeyey kan weligiis nool; waayo, dowladnimadiisu waa
dowladnimo aan weligeed dhammaanayn, boqortooyadiisuna
waxay raagtaa fac ilaa fac; **35** oo kuwa dhulka deggan oo
dhammu isaga lama simna, siduu doono ayuu ciidanka
samada iyo dadka dhulka degganba ka yeelaa; mana jiro
mid gacantiisa joojin karaa ama ku odhan karaa, Maxaad
samaynaysaa? **36** Isla markiiba waxgarashadaydii way ii soo
noqotay; oo ammaanta boqortooyadayda aawadeed ayaa
weynaantaydii iyo dhalaalkaygii iigu soo noqdeen; markaasay
waaniyayaashaydii iyo saraakiishaydii i doondooneen, oo
boqortooyadaydii baa la ii dhisay, oo derejo aad u weyn
baa la iigu daray. **37** Haatan anigoo ah Nebukadnesar
waxaan ammaanayaa oo sarraysiinayaa, oo cisaynayaa
Boqorka samada, waayo, shuqulladiisa oo dhammu waa run,
jidadkiisuna waa xaq; oo kuwa kibirka ku socdana isagaa
kara inuu hoosaysiiyo.

**5** Markaasaa Boqor Beelshaasar wuxuu diyaafad weyn
u sameeyey kun nin oo saraakiishiisii ah, markaasuu
khamri ku hor cabbay kunkii nin. **2** Beelshaasar markuu
dhadhamiyey khamrigii ayuu amray in la keeno weelashii
dahabka iyo lacagta ahaa, oo aabbihiis Nebukadnesar ka
soo qaaday macbudkii Yeruusaalem ku yiil, in boqorka iyo
saraakiishiisa, iyo naagihiisii, iyo naagihiisii addoommaha
ahaa ay wax ku cabbaan. **3** Markaasay keeneen weelashii
dahabka ahaa oo laga soo qaaday macbudkii guriga Ilaah
ahaa ee Yeruusaalem ku yiil; oo boqorkii iyo saraakiishiisii,
iyo naagihiisii iyo naagihiisii addoommaha ahaa ay wax ku
cabbeen. **4** Khamri bay cabbeen, oo waxay ammaaneen
ilaahyadii dahabka, iyo lacagta, iyo naxaasta, iyo birta iyo
qoryaha, iyo dhagaxa ahaa. **5** Isla saacaddaas waxaa
soo baxay nin gacantiis faraheed, oo waxay wax ku
qoreen nuuraddii derbiga ka soo hor jeeday laambadda,
oo gurigii boqorka, boqorkiina wuu arkay gacantii inteedii
wax qortay. **6** Markaasaa boqorka wejigiisii beddelmay,
fikirradiisiina wuu la welwelay; xubnihii dhexdiisuna way
debceen, lowyihiisiina way isku dhacdhaceen. **7** Markaasaa
boqorkii kor u qayliyey oo yidhi, Ii keena xiddigiyayaasha iyo
kuwa reer Kaldayiin ah iyo kuwa wax sheega. Boqorkiina
waa la hadlay raggii xigmadda lahaa ee Baabuloon oo ku
yidhi, Ku alla kii fartan akhriya, oo fasirkeeda ii caddeeya,
waxaa loo gelinayaa dhar guduudan, qoortana waxaa loo
sudhayaa silsilad dahab ah, oo wuxuu noqon doonaa taliyaha
saddexaad oo boqortooyada. **8** Markaasaa waxaa soo
galay boqorka raggiisii xigmadda lahaa oo dhan, laakiin
fartii way akhriyi kari waayeen, boqorkiina fasirkii way u
caddayn kari waayeen. **9** Markaasaa Boqor Beelshaasar
aad iyo aad u argaggaxay, wejigiisiina waa beddelmay,
saraakiishiisiina way welweleen. **10** Markaasaa boqorka iyo
saraakiishiisii hadalkoodii aawadiis ayaa boqoraddii u soo
gashay gurigii diyaafadda; kolkaasay boqoraddii hadashay
oo tidhi, Boqorow, weligaaba noolow; fikirradaadu yay kaa
argaggixin, wejigaaguna yuusan beddelmin. **11** Nin ruuxii
ilaahyada quduuska ahu ku jiro ayaa boqortooyadaada
jooga, oo jeerkii aabbahaa ayaa waxaa laga helay nuur iyo
waxgarasho iyo xigmad u eg xigmaddii ilaahyada; oo Boqor
Nebukadnesar oo ahaa aabbahaa, boqorow, wuxuu isaga ka
dhigay madaxdii saaxiriinta, iyo xiddigiyayaasha, iyo kuwa
reer Kaldayiin ah, iyo kuwa wax sheega; **12** maxaa yeelay,
waxaa laga helay ruux aad u wanaagsan, iyo aqoon, iyo
waxgarasho, riyooyinkana wuu fasiri jiray, waxa daahanna
wuu muujin jiray, shakigana wuu saari jiray, oo kaasu waa
Daanyeel, kii boqorku u bixiyey Beelteshaasar. Haddaba
Daanyeel ha loo yeedho, oo isna fasirka wuu caddayn
doonaa. **13** Markaasaa Daanyeel la soo hor taagay boqorka.
Boqorkiina waa la hadlay oo Daanyeel ku yidhi, Ma waxaad
tahay Daanyeelkii ka mid ahaa kuwii Yahuudah laga soo
dhacay, oo boqorkii aabbahay ahaa Yahuudah ka keenay?
**14** Waxaa la iiga kaa sheegay inuu ruuxa ilaahyadu kugu
jiro, oo lagaa dhex helay nuur iyo waxgarasho iyo xigmad
aad iyo aad u wanaagsan. **15** Haddaba raggii xigmadda
lahaa iyo xiddigiyayaashii baa lay soo hor taagay inay
fartan akhriyaan, oo ay ii caddeeyaan fasirkeeda, laakiin
way kari waayeen inay ii caddeeyaan waxaas fasirkiisa. **16**
Laakiinse waxaa la iiga kaa sheegay inaad wax fasiri kartid,
shakigana saari kartid; haddaba haddaad farta akhriyi kartid
oo aad fasirkeeda caddayn kartid, waxaa lagu xidhi doonaa
dhar guduudan, waxaad qoortana ku qabi doontaa silsilad
dahab ah, oo waxaad noqon doontaa taliyaha saddexaad oo
boqortooyada. **17** Markaasaa Daanyeel jawaabay oo yidhi
isagoo boqorkii hor taagan, Boqorow, hadiyadahaaga iska
hayso, abaalgudyadaadana ku kale sii; habase yeeshee
farta waan kuu akhriyi doonaa, fasirkana waan kuu caddayn
doonaa. **18** Boqorow, Ilaaha ugu Sarreeyaa wuxuu aabbahaa
Nebukadnesar siiyey boqortooyada, iyo weynaan, iyo
ammaan, iyo derejo, **19** oo weynaantii uu siiyey aawadeed
ayay dadyowgii iyo quruumihii iyo kuwii kala afka ahaa
oo dhammu la gariireen oo ka cabsadeen. Kuu doonayay
wuu dilay, kuu doonayayna wuu reebay; oo kuu doonayay
wuu sarraysiiyey, kuu doonayayna wuu hoosaysiiyey. **20**
Laakiinse markuu dhulka kor isaga qaaday oo ruuxiisii
kibir la qallafsanaaday ayaa carshigii boqornimadiisa laga
dejiyey, ammaantiisiina waa laga qaaday. **21** Markaasaa
binu-aadmiga laga eryay, qalbigiisiina waxaa laga dhigay
sida kan dugaagga, wuxuuna la joogay dameeraha duurka,
oo wuxuu doogga u daaqay sida dibida, jidhkiisana waxaa
qoyay dharab samada ka soo dhacay ilaa uu ka ogaaday in
Ilaaha ugu Sarreeyaa u taliyo boqortooyada dadka, oo uu
madax uga dhigo ku alla kii uu doonayo. **22** Beelshaasarow,
adigoo wiilkiisii ah, ma aadan is-hoosaysiin in kastoo aad
waxyaalahan oo dhan ogayd; **23** laakiinse waad iska
sarraysiisay Sayidka samada; oo waxaa lagu hor keenay
weelashii gurigiisa, markaasaa adiga iyo saraakiishaada, iyo
naagahaaga, iyo naagahaaga addoommaha ahu aad khamri
ku cabteen; oo waxaad ammaantay ilaahyada lacagta iyo
dahabka ah, iyo kuwa naxaasta, iyo birta, iyo qoryaha, iyo
dhagaxa ah, oo aan waxba arkin, waxna maqlin, waxna
ogayn: oo Ilaaha neeftaadu gacantiisa ku jirto, oo jidadkaaga
oo dhan lehna ma aadan ammaanin; **24** dabadeed gacanta
isaga xaggiisaa laga soo diray, oo waxay qortay fartan.
**25** Oo waa tan fartii la qoray, MENE, MENE, TEQEL,

UUFARSIIN. **26** Waa kan waxaas fasirkiisii: MENE: Waxay ka dhigan tahay, Ilaah waa tiriyey boqortooyadaada, wuuna dhammeeyey. **27** TEQELna waxaa weeye, Kafadaha waa lagugu miisaamay oo wax baa kaa dhinnaaday. **28** FERESna waxaa weeye, Boqortooyadaadii waa la qaybiyey, oo waxaa la siiyey reer Maaday iyo reer Faaris. **29** Markaasaa Beelshaasar amar bixiyey, oo waxay Daanyeel u xidheen dhar guduudan, qoortana waxaa loo geliyey silsilad dahab ah, markaasaa la naadiyey inuu noqonayo taliyaha saddexaad oo boqortooyada. **30** Habeenkaasaa la dilay Beelshaasar boqorkii reer Kaldayiin. **31** Oo Daariyus oo ahaa reer Maaday oo laba iyo lixdan jir ahaa, ayaa boqortooyadii qabsaday.

**6** Daariyus waxaa la wanaagsanaa inuu boqortooyadiisa u yeelo boqol iyo labaatan amiir, oo boqortooyada oo dhan wada gaadha; **2** oo wuxuu iyagii ka sara mariyey saddex taliye, oo Daanyeel ka mid ahaa; inay amiirradu iyaga la xisaabtamaan, oo aan boqorka khasaare ku dhicin. **3** Markaasaa Daanyeel laga soocay taliyayaashii iyo amiirradii, maxaa yeelay, waxaa isaga ku jiray ruux aad u wanaagsan; boqorkiina wuxuu ku fikiray inuu talada boqortooyada oo dhan u dhiibo. **4** Markaasaa taliyayaashii iyo amiirradii waxay doondooneen sabab ay Daanyeel ku dacweeyaan oo xagga boqortooyada ku saabsan; laakiinse way waayeen sabab iyo xumaan toona; maxaa yeelay, isagu wuxuu ahaa aamin, oo qalad iyo xumaan toona lagama helin. **5** Markaasay nimankaasu waxay isku yidhaahdeen, Sabab ku heli mayno Daanyeelkan, haddaynan ku helin xagga sharciga ku saabsan Ilaahiisa. **6** Markaasaa taliyayaashii iyo amiirradii la shireen boqorkii, oo waxay ku yidhaahdeen, Boqor Daariyusow, weligaaba noolow. **7** Madaxweynayaashii boqortooyada oo dhan, iyo taliyayaashii, iyo amiirradii, iyo waaniyayaashii, iyo saraakiishii, waxay ku tashadeen inay dhisaan qaynuun boqornimo iyo amar leh, Ku alla kii intii soddon maalmood ah wax weyddiista ilaah kale ama nin, adiga mooyaane, Boqorow, waa in lagu rido bohosha libaaxyada. **8** Haddaba, Boqorow, amarka dhis, oo qorniinka saxeex si uusan u beddelmin, sida sharciga reer Maaday iyo reer Faaris uusan u beddelmin oo kale. **9** Sidaas daraaddeed Boqor Daariyus waa saxeexay qorniinkii iyo amarkii. **10** Daanyeelna markuu ogaaday in qorniinkii la saxeexay ayuu gurigiisii galay, haddaba daaqadihii qolkiisa oo xagga Yeruusaalem u jeeday way furnaayeen, oo saddex jeer buu maalintiiba jilbo joogsan jiray oo tukan jiray, oo Ilaahiis ku mahadnaqi jiray, siduu hore u yeeli jiray. **11** Markaasay nimankii isu soo shireen, oo waxay heleen Daanyeel oo wax weyddiisanaya oo baryaya Ilaahiis. **12** Markaasay u soo dhowaadeen, oo waxay boqorka hortiisii kaga hadlen wax ku saabsan amarkii boqorka, oo waxay yidhaahdeen, Miyaadan saxeexin amar leh, Ku alla kii, intii soddon maalmood ah, wax weyddiista ilaah kale ama nin, adiga mooyaane, waa in lagu rido bohosha libaaxyada? Boqorkiina waa u jawaabay oo ku yidhi, Taasu waa run, sida sharciga reer Maaday iyo reer Faaris ku qoran oo aan beddelmi karin. **13** Markaasay jawaabeen oo waxay boqorkii hortiisa ka yidhaahdeen, Boqorow, Daanyeelkii ka mid ahaa kuwii Yahuudah laga soo dhacay, dan kama leh adiga iyo amarkii aad saxeexday toona, laakiinse saddex jeer buu maalin walba Ilaahiisa wax weyddiistaa. **14** Markaasaa boqorkii markuu hadalkaas maqlay ayuu aad uga xumaaday, oo isku dayay inuu Daanyeel samatabbixiyo; oo ilaa qorraxdu ka dhacday ayuu hawshoonayay inuu isaga badbaadiyo. **15** Markaasay nimankii giddigood boqorkii ku soo shireen, oo waxay boqorkii ku yidhaahdeen, Bal ogow, Boqorow, inay sharci reer Maaday iyo reer Faaris tahay inaan la beddelin qaynuun ama amar uu boqorku dhiso. **16** Markaasaa boqorkii amray, oo Daanyeel waa la soo kexeeyey oo lagu dhex tuuray bohoshii libaaxyada. Boqorkiina waa la hadlay Daanyeel, oo ku yidhi, Ilaahaaga aad had iyo goorba u adeegto ayaa ku samatabbixin doona. **17** Markaasaa dhagax la keenay, oo bohoshii afkeedii la saaray; oo boqorkii baa ku shaabadeeyey shaabaddiisii, iyo shaabaddii saraakiishiisa, inaan waxba laga beddelin xaaladda Daanyeel. **18** Dabadeedna boqorkii baa gurigiisii tegey, oo habeenkaas wuu soomanaa: alaabtii muusikadana looma keenin, hurdadiina waa ka duushay. **19** Boqorkii intuu aroor hore kacay ayuu degdeg u tegey bohoshii libaaxyada. **20** Oo markuu u soo dhowaaday bohoshii Daanyeel ku jiray ayuu si weyn u ooyay; markaasa boqorkii hadlay oo Daanyeel ku yidhi, Daanyeelow, Ilaaha nool midiidinkiisow, Ilaahaaga aad had iyo goor u adeegtaa ma awoodi karaa inuu libaaxyada kaa samatabbixiyo? **21** Markaasaa Daanyeel boqorkii ku yidhi, Boqorow, weligaaba noolow. **22** Ilaahay malaa'igtiisii buu soo diray, oo waxay xidhay libaaxyada afkoodii, oo waxba ima ay yeelin; waayo, wuxuu arkay inaanan xaq qabin; xaggaagana, Boqorow, waxba kuma aanan yeelin. **23** Dabadeedna boqorkii aad iyo aad buu u farxay, oo wuxuu ku amray in Daanyeel bohosha laga soo bixiyo. Sidaasaana Daanyeel bohoshii looga soo bixiyey, korkiisiina innaba waxyeello lagama helin, maxaa yeelay, Ilaahiis buu isku halleeyey. **24** Dabadeedna boqorkii baa amar bixiyey oo waxaa la keenay nimankii Daanyeel dacweeyey, oo bohoshii libaaxyada ayaa lagu dhex tuuray, iyagii iyo carruurtoodii iyo naagahoodiiba; markaasaa libaaxyadii

qabsadeen intayan bohoshii salkeeda soo gaadhin, lafahoodii
oo dhanna way burbursadeen. 25 Markaasaa boqorkii
Daariyus warqado u qoray dadyowgii, iyo quruumihii, iyo
kuwii kala afka ahaa oo dhan, oo dhulka oo dhan degganaa;
oo wuxuu ku yidhi, Nabadu ha idinku badato. 26 Waxaan
amar ku bixinayaa in dadka dowladnimada boqortooyadayda
oo dhan ay ku hor gariiraan oo ka cabsadaan Ilaaha
Daanyeel; waayo, isagu waa Ilaaha nool, oo weligiis
jiraya, boqortooyadiisuna waa mid aan la baabbi'in karayn,
dowladnimadiisuna way jiri doontaa ilaa ugudambaysta. 27
Isagu wax waa samatabbixiyaa oo badbaadiyaa, samada
iyo dhulkana wuxuu ku sameeyaa calaamado iyo yaabab,
waana kii Daanyeel ka samatabbixiyey xooggii libaaxyada.
28 Sidaasuu Daanyeelkanu ugu barwaaqoobay boqornimadii
Daariyus, iyo boqornimadii Kuuroskii reer Faaris.

**7** Sannaddii kowaad oo boqorkii Baabuloon oo ahaa
Beelshaasar, ayaa Daanyeel riyooday, waxna waa la
tusay isagoo sariirtiisa ku jiifa; markaasuu riyadii qoray,
waxyaalihii dhammaantoodna wuu sheegay. 2 Daanyeel
wuu hadlay oo yidhi, Waxaan riyadaydii habeennimo ku
arkay afartii dabaylood oo samada, oo badda weyn ku soo
dhacaysa. 3 Oo waxaa baddii ka soo baxay afar bahal oo
waaweyn, ee midba kan kale ka duwan yahay. 4 Midkii
kowaad wuxuu u ekaa libaax, baalal gorgorna wuu lahaa, oo
waan fiirinayay ilaa baalashiisii laga rifay, oo dhulka kor baa
looga qaaday, oo waxaa lagu taagay laba lugood sidii nin
oo kale, nin qalbigiisna waa la siiyey. 5 Oo bal eeg, bahal
kale oo labaad oo orso u ekaa, oo dhinac keliya ayuu ku
taagnaa, oo saddex feedhood baa afka ugu jiray ilkihiisa
dhexdood: oo waxaa lagu yidhi, War kac, oo dad badan cun.
6 Dabadeedna waxaan arkay mid kale oo shabeel u eg,
oo dhabarka ku leh afar baal oo haadeed, bahalku wuxuu
kaloo lahaa afar madax; oo waxaa la siiyey dowladnimo. 7
Dabadeedna waxaan riyadii habeennimada ku arkay bahalkii
afraad, oo ahaa mid laga cabsado oo xoog badan, aad
buuna u darnaa; oo wuxuu lahaa ilko waaweyn oo bir ah; wax
buuna cunay oo burburiyey, intii hadhayna wuu ku tuntay;
oo wuu ka wada duwanaa bahalladii kale oo ka horreeyey
isaga; oo wuxuu lahaa toban gees. 8 Waxaan ka fiirsaday
geesihii, oo bal eeg, waxaa dhexdoodii ka soo baxay gees
kale oo yar; markaasaa hortiisa waxaa ka ruqay saddex gees
oo kuwii hore ka mid ah, geeskaas waxaa ku yiil indho u eg
indho dad, iyo af ku hadlaya waxyaalo waaweyn. 9 Waxaan
fiirinayay ilaa carshiyo meel la dhigay, oo waxaa ku fadhiistay
mid da' weyn; oo dharkiisu wuxuu u caddaa sida barafka
cad, timaha madaxiisuna waxay u ekaayeen sida suuf saafi
ah, carshigiisu wuxuu ahaa olol dab ah, giringirihiisuna
waxay ahaayeen dab wax gubaya. 10 Oo waxaa hortiisa ka
soo dareeray oo ka soo baxay durdur dab ah; oo waxaa u
adeegayay kumaan kun iyo kumaan kun, hortiisana waxaa
taagnaa toban kun oo min toban kun ah; oo xukunkiina
waa la dhigay, kitaabbadiina waa la furay. 11 Wakhtigaas
aad baan u fiiriyey, codkii hadallada waaweynaa oo geesku
ku hadlay aawadiis; oo waxaan fiirinayay ilaa bahalkii la
dilay, bakhtigiisiina waa la baabbi'iyey, oo waxaa loo dhiibay
si dab loogu gubo. 12 Oo bahalladii kale ee hadhayna
dowladnimadoodii waa laga qaaday, cimrigoodiise waa la
dheereeyey ilaa waa iyo wakhti. 13 Riyadii habeennimada
waxaan ku arkay mid u eg wiilkii aadan aha oo ku yimid
daruuraha samada, oo wuxuu u yimid, kii da'da weynaa, oo
waa loo soo dhoweeyey oo hortiisaa la soo taagay. 14 Oo
waxaa la siiyey dowladnimo iyo ammaan iyo boqortooyo,
inay dadyowga, iyo quruumaha, iyo kuwa kala afka ahu u
wada adeegaan. Dowladnimadiisu waa dowladnimo weligeed
jiraysa, oo aan dhammaanayn, boqortooyadiisuna waa mid
aan la baabbi'in doonin. 15 Anigan Daanyeel ahna, ruuxaygu
jidhkayguu ku murugaysnaa oo waxyaalihii lay tusayna,
way iga argaggixiyeen. 16 Oo waxaan ku soo dhowaaday
kuwii meeshaas taagnaa midkood, oo waxaan weyddiiyey
runta ku saabsan waxyaalahan oo dhan. Markaasuu ii
sheegay oo ii caddeeyey waxyaalahaas fasirkoodii oo
dhan. 17 Afartan bahal oo waaweynaa waa afar boqor,
oo dunida ka kici doona. 18 Laakiinse Ka ugu Sarreeya
quduusiintiisa ayaa boqortooyada qaadan doonta, oo waxay
yeelan doonaan boqortooyada weligood iyo xataa weligood
iyo weligoodba. 19 Dabadeedna waxaan jeclaaday inaan
ogaado runtii ku saabsanayd bahalkii afraad, oo ka duwanaa
dhammaantood, oo aad iyo aad cabsida u lahaa, oo ilkihiisu
birta ahaayeen, oo ciddiyahiisuna naxaasta ahaayeen; oo
wax cunayay, oo waxna burbursanayay, intii hadhayna
ku tumanayay, 20 iyo tobankii gees oo madaxiisa ku yiil,
iyo geeskii kale oo soo baxay oo hortiisa ay saddexdu
ka dhaceen, kaasu waa geeskii indhaha lahaa, iyo afka
waxyaalaha waaweyn ku hadlayay, oo araggiisu kuwa kale
ka xoog badnaa. 21 Waan fiiriyey, oo isla geeskaas ayaa
quduusiinta la diriray; wuuna ka adkaaday; 22 ilaa uu kii
da'da weynaa yimid, oo xukunkii la siiyey quduusiintii Ka
ugu Sarreeya, oo uu yimid wakhtigii ay quduusiintu yeelan
lahayd boqortooyada. 23 Sidan buu yidhi, Bahalka afraad
wuxuu ahaan doonaa boqortooyo afraad o dunida ka kici
doonta, taasu waa ka duwanaan doontaa boqortooyooyinka
kale oo dhan, oo waxay cuni doontaa dunida oo dhan,
wayna ku tuman doontaa, oo burburin doontaa. 24 Tobanka

gees xaggoodana, waxaa boqortooyadaas ka kici doona
toban boqor, dabadeedna mid kalaa kici doona iyaga ka
dib, oo isagu waa ka duwanaan doonaa kuwii hore, oo
saddex boqor buu dejin doonaa. 25 Oo hadal ka gees
ah Ka ugu Sarreeya ayuu ku hadli doonaa, wuxuuna aad
u dhibi doonaa quduusiinta Ka ugu Sarreeya, oo wuxuu
ku fikiri doonaa inuu beddelo wakhtiyada iyo sharciga, oo
gacantiisaana loo gelin doonaa ilaa wakhti iyo wakhtiyo
iyo wakhti badhkiis. 26 Laakiinse xukunku wuu ahaan
doonaa, oo waxaa laga qaadi doonaa dowladnimadiisa, si
loo dhammeeyo oo loo baabbi'iyo ilaa ugudambaysta. 27
Markaasaa boqortooyada iyo dowladnimada, iyo weynaanta
boqortooyooyinka samada ka hooseeya oo dhan, waxaa
la siin doonaa dadka quduusiinta Ka ugu Sarreeya.
Boqortooyadiisu waa boqortooyo weligeed jiraysa, oo
dowladaha oo dhammuna isagay u adeegi doonaan oo
addeeci doonaan. 28 Waa kan xaalka dabaadigiisii. Aniga
Daanyeel ah, fikirradaydu aad bay iiga argaggixiyeen,
wejigaygiina waa beddelmay, laakiinse qalbigaygaan ku
hayay.

**8** Sannaddii saddexaad oo boqornimadii Boqor Beelshaasar
ayaa riyo ii muuqatay anigan Daanyeel ah, taasuna way
ka dambaysay tii markii hore ii muuqatay. 2 Oo wax baan
riyadii ku arkay, oo haddaba saas bay ahayd in markaan
riyada arkay aan joogay daartii weynayd oo ku tiil Shuushan
oo ku jirtay gobolka Ceelaam; oo riyadii baan haddana arkay
oo waxaan ag joogay Webi Uulay. 3 Markaasaan indhahaygii
kor u qaaday, oo waxaan arkay wan laba gees leh oo webiga
hortiisa taagan; oo labada geesna way dheerdheeraayeen,
laakiinse mid baa ka dheeraa midka kale; oo kii dheeraa
baa markii dambe soo baxay. 4 Oo waxaan arkay wankii oo
wax u riixaya xagga galbeed iyo xagga woqooyi, iyo xagga
koonfureed, oo bahalna ma hor istaagi karin, mana jirin mid
gacantiisa wax ka bixin karay; laakiinse siduu doonayay
ayuu yeeli jiray, wuuna isweyneeyey. 5 Oo intii aan ka
fiirsanayay ayaa waxaa galbeed ka yimid orgi, wuxuuna kor
maray dhulka dushiisa oo dhan, dhulkana ma uusan taaban:
orgiguna wuxuu labada indhood dhexdooda ku lahaa gees
weyn. 6 Oo wuxuu u yimid wankii labada gees lahaa oo aan
arkay, isagoo webiga hortiisa taagan, kolkaasuu ku orday
isagoo aad u cadhaysan. 7 Oo waxaan arkay isagoo wankii
u soo dhowaaday, aad buuna ugu xanaaqay, oo wankii
buu hardiyey, labadiisii geesna wuu ka jebiyey. Wankiina
ma lahayn xoog uu iskaga celiyo, laakiinse dhulkuu ku
tuuray, wuuna ku tuntay, mana jirin mid wanka orgiga ka
samatabbixin karaa. 8 Markaasaa orgigii aad iyo aad isu
weyneeyey, oo markuu aad xoog u yeeshay ayaa geeskii
weynaa ka jabay; markaasaa beddelkiisii waxaa u soo baxay
afar gees oo waaweyn oo u jeeday samada afarteeda jaho.
9 Markaasaa midkood waxaa ka soo baxay gees yar oo
aad ugu weynaaday xagga koonfureed iyo xagga bari, iyo
xagga waddankii quruxda lahaa. 10 Oo xataa wuu ka xoog
weynaaday ciidanka samada, markaasuu ciidankii qaarkiis
iyo xiddigihii qaarkood dhulka ku soo tuuray, wuuna ku tuntay.
11 Oo weliba wuu ka sii xoog weynaaday amiirkii ciidanka,
oo wuxuu ka qaaday qurbaankii la gubanayay oo joogtada
ahaa, oo meeshiisii quduuska ahaydna hoos baa loo tuuray.
12 Markaasaa ciidankii iyo qurbaankii joogtada ahaaba
isagii la siiyey, waxaana loo siiyey xadgudub, markaasuu
runtii dhulka ku soo tuuray, wuxuu sameeyey ayuuna ku
barwaaqoobay. 13 Dabadeedna waxaan maqlay mid quduus
ah oo hadlaya, markaasaa mid kale oo quduus ahu wuxuu
ku yidhi kii hadlay, Ilaa goormay ahaan doontaa riyada
ku saabsan qurbaanka joogtada ah, iyo xadgudubka wax
baabbi'iya, si meesha quduuska ah iyo ciidankaba loogu
tunto? 14 Markaasuu igu yidhi, Ilaa laba kun iyo saddex
boqol oo fiid iyo subax, dabadeedna meesha quduuska ah
waa la nadiifin doonaa. 15 Oo markaan anigoo Daanyeel ah
arkay riyadii ayaan doondoonay inaan garto, oo bal eeg,
waxaa i soo hor istaagay wax nin u eg. 16 Oo nin codkiis
ayaan ka dhex maqlay Webi Uulay wuuna dhawaaqay, oo
yidhi, Jibriilow, ninkan riyada garansii. 17 Sidaas daraaddeed
ayuu u soo dhowaaday meeshii aan taagnaa, oo markuu
yimid waan baqay, wejigaanna u dhacay, laakiinse wuxuu
igu yidhi, Wiilka Aadamow, garo, waayo, riyada waxaa leh
wakhtiga ugudambaysta. 18 Oo intuu ila hadlayay ayaan
hurdo aad u weyn la dhacay anigoo wejiga dhulka ku hayo,
laakiinse isagii baa i taabtay oo i sara joojiyey. 19 Oo wuxuu
igu yidhi, Bal eeg, waxaan ku ogeysiinayaa waxa ahaan
doona wakhtiga ugu dambaysta ee cadhada, waayo, waxaa
leh wakhtiga la ballamay ee ugu dambaysta ah. 20 Wankii
aad aragtay oo labada gees lahaa waa labada boqor ee
dalka Maaday iyo dalka Faaris. 21 Orgigiina waa boqorka
dalka Gariigta, oo geeskii weynaa oo labadiisa indhood
dhexdooda ku yiilna waa boqorka kowaad. 22 Oo midkii ka
jabay meeshii afartu soo istaagtay, quruuntaas waxaa ka soo
bixi doonta afar boqortooyo, laakiinse xooggiisa ma yeelan
doonaan. 23 Marka ugu dambaysta boqortooyadooda, ee uu
dembilayaasha wakhtigoodu buuxsamo waxaa kici doona
boqor wejigiisa laga cabsado, oo garanaya waxyaalaha
daahan. 24 Oo xooggiisuna wuu weynaan doonaa, laakiinse
ma aha xagga isaga xooggiisa, oo aad buu si yaab leh
wax u baabbi'in doonaa, wuuna ku barwaaqoobi doonaa

wuxuu sameeyo, oo wuxuu baabbi'in doonaa kuwa xoogga
badan iyo dadka quduuska ah. 25 Oo siyaasaddiisa ayuu
khiyaanada gacantiisa kaga guulaysan doonaa; markaasuu
xagga qalbiga iska weynayn doonaa, oo kuwo badan oo
nabadgelyaysan ayuu baabbi'in doonaa. Wuxuu kaloo is-
hor taagi doonaa Amiirka amiirrada; laakiinse waa la jejebin
doonaa isagoo aan gacan la saarin. 26 Oo riyadii fiidadka
iyo subaxyada ee laguu sheegay waa run, laakiinse adigu
riyada xidh, waayo, waxaa iska leh maalmo badan oo iman
doona. 27 Markaasaan anigoo Daanyeel ahu suuxay, dhawr
maalmoodna waan bukay, dabadeedna waan kacay, oo
shuqulkii boqorka qabtay: oo riyadii waan la yaabay, laakiinse
ciduna ma garan.

9 Sannaddii kowaad oo Daariyus kii ahaa ina Ahashwerus
oo reer Maaday, oo boqorka looga dhigay boqortooyadii
reer Kaldayiin, 2 sannaddii kowaad oo boqornimadiisa
ayaan anigoo Daanyeel ahu kitaabbadii ka gartay intay
ahaayeen sannadihii Ilaah kala hadlay Nebi Yeremyaah, oo
ku saabsanaa wakhtiga la dhammaystirayo baabbi'inta wax la
baabbi'inayo Yeruusaalem, waxayna ahaayeen toddobaatan
sannadood. 3 Oo waxaan wejigayga u jeediyey Sayidka
Ilaah ah inaan ku doondoono tukasho iyo baryootan, anoo
sooman, oo joonyado guntan, oo dambas ku fadhiya. 4
Oo Rabbiga ah Ilaahayga ayaan baryay, oo wax baan u
qirtay, oo aan idhi, Sayidow, waxaad tahay Ilaaha weyn oo
laga cabsado, oo axdi xajiya, oo u naxariista kuwa isaga
jecel oo amarradiisa dhawra; 5 waannu dembaabnay, oo
wax baannu si qalloocan u samaynay, oo shar baannu
falnay, oo waannu caasiyownay, oo xataa waannu ka
baydhnay amarradaadii iyo xukummadaadii, 6 oo ma
aannu dhegaysan nebiyadii addoommadaada ahaa, oo
magacaaga kula hadlay boqorradayada iyo amiirradayada,
iyo awowayaashayo, iyo dadka waddanka deggan oo
dhan. 7 Sayidow, xaqnimada adigaa iska leh, laakiinse
annagu waxaannu leennahay qasnaan iyo ceeb sida maanta
annagoo ah dadka reer Yahuudah, iyo kuwa ku dhaqma
Yeruusaalem, iyo reer binu Israa'iil oo dhan, iyo kuwa dhow
iyo kuwa fog oo aad dalalka kale u kaxaysay xadgudubkii
ay kugu xadgudbeen awadiis. 8 Sayidow, waxaannu
leennahay qasnaan iyo ceeb, annaga iyo boqorradayada
iyo amiirradayada, iyo awowayaashayaba, maxaa yeelay,
waannu kugu dembaabnay. 9 Sayidka Ilaahayaga ahu
wuxuu leeyahay naxariis iyo dembidhaaf, waayo, waannu
ku caasiyownay; 10 mana aannu addeecin codkii Rabbiga
Ilaahayaga ah, iyo inaannu ku soconno sharciyadiisa
ay na hor dhigeen nebiyadii ahaa addoommadiisa. 11
Haah, reer binu Israa'iil oo dhammu sharcigaagii way ku
xadgudbeen, oo xataa way ka baydheen, si aanay u addeecin
codkaaga, sidaas daraaddeed ayaa cadhada lanoogu riday,
iyo weliba dhaarta ku qoran sharciga Muuse, oo ahaa
addoonkii Ilaah; waayo, waannu kugu dembaabnay. 12
Hadalladiisii uu kaga hadlay annaga iyo xaakinnadayada na
xukumi jiray wuxuu ku adkeeyey xumaan weyn oo uu nagu
soo dejiyey; waayo, samada hoosteeda oo dhan laguma
samayn waxa Yeruusaalem lagu sameeyey oo kale. 13
Sida ku qoran sharciga Muuse, xumaantan oo dhammu
annagay nagu dhacday, welise Rabbiga Ilaahayaga ah
raallinimo kama aannu baryin, si aannu uga soo jeesanno
dembiyadayada, oo aannu runtaada uga fikirno. 14 Haddaba
sidaas daraaddeed baa Rabbigu xumaanta u fiiriyey, oo
uu noogu soo dejiyey, waayo, Ilaaha Rabbigayaga ahu
wax alla wuxuu sameeyo oo dhan waa ku xaq, oo annana
ma aannu addeecin codkiisii. 15 Haddaba Ilaahayaga
ahow, oo dadkiisa gacanta xoogga leh Masar kaga soo
bixiyayow, oo maanta ammaan isu soo jiidayow, waannu
dembaabnay, oo wax shar ah baannu falnay. 16 Sayidow,
waan ku baryayaaye xaqnimadaada oo dhan aawadeed,
Dhirifkaaga iyo cadhadaaduba ha ka leexdeen magaaladaada
Yeruusaalem, oo ah buurtaada quduuska ah; waayo,
dembiyadayada iyo xumaantii awowayaashayo aawadood
ayaa Yeruusaalem iyo dadkaagiiba kuwo ceebaysan ugu
noqdeen inta nagu wareegsan oo dhan. 17 Haddaba
Ilaahayow, bal maqal tukashadayda iyo baryadayda anoo ah
addoonkaaga, oo aawadaa, Sayidow, uga dhig in wejigaagu
ka hor iftiimo meeshaada quduuskaa oo kharribantay. 18
Ilaahayow, dhegahaaga soo jeedi oo i maqal; oo indhahaaga
kala qaad, oo bal arag baabba'ayaga, iyo magaaladii
magacaaga loogu yeedhayba, waayo, annagu kugu baryi
mayno xaqnimo aannu leennahay, laakiinse naxariistaada
ayaannu kugu baryaynaa. 19 Sayidow, na maqal; Sayidow, na
cafi; Sayidow, na dhegayso oo yeel; ha raagin; aawadaa baan
kugu baryaynaa Ilaahayow, maxaa yeelay magaaladaada
iyo dadkaagaba waxaa loogu yeedhay magacaaga. 20 Oo
intii aan hadlayay, oo aan tukanayay, oo aan dembigayga
iyo dembigii dadkayga reer binu Israa'iil qiranayay, oo aan
Rabbiga Ilaahayga ah u baryayay buurta quduuska ah
oo Ilaahay, 21 intii aan ducaysanayay ayaa ninkii Jibriil
ahaa, oo aan markii hore riyada ku arkay, degdeg iigu soo
duulay, wakhtigii qurbaankii fiidkii la bixiyey, oo i taabtay.
22 Markaasuu wax i baray, oo ila hadlay, oo wuxuu igu
yidhi, Daanyeelow, haatan waxaan u soo baxay inaan kaa
dhigo mid wax aad u yaqaan. 23 Markaad baryootankaagii
bilowday ayaa amarku soo baxay, oo waxaan u imid inaan

kuu sheego; waayo, aad baa laguu jecel yahay, haddaba
sidaas daraaddeed xaalka ka fiirso, oo riyada garo. 24
Toddobaatan toddobaad baa loo qabtay dadkaaga iyo
magaaladaada quduuska ah, in xadgudubka la joojiyo, oo
dembiyada la dhammeeyo, oo xumaanta laga heshiiyo,
oo la keeno xaqnimo weligeed ah, iyo in la shaabadeeyo
waxyaalo lays tuso iyo waxyaalo la sii sheego, iyo in la
subko kan ugu quduusan. 25 Haddaba ogow oo garo in
tan iyo markii amarku soo baxay in Yeruusaalem la soo
celiyo oo la dhiso ilaa uu yimaado Kan subkan oo ah amiirka
waxaa ahaan doona toddoba toddobaad, iyo laba iyo lixdan
toddobaad; haddana wakhtiyada cidhiidhiga ah waa la dhisi
doonaa oo waxaa loo yeeli doonaa jidad iyo derbi. 26 Oo
laba iyo lixdanka toddobaad dabadood ayaa Kan subkan
la gooyn doonaa waxbana ma haysan doono, oo dadka
amiirka iman doona ayaa baabbi'in doona magaalada iyo
meesha quduuska ah oo dhammaadkiisuna wuxuu ahaan
doona mid daad leh, oo xataa ilaa ugu dambaysta waxaa jiri
doona dagaal; baabba'na waa la goostay. 27 Oo toddobaad
ayuu kuwo badan axdi kula dhigan doonaa: markaasuu
toddobaadka badhtankiisa joojin doonaa allabariga iyo
qurbaankaba; oo dushiisa waxaa ku iman doona mid wax
baabbi'iya ilaa dhammaadkii la goostay lagu dejiyo kan wax
baabbi'iya.

10 Sannaddii saddexaad oo boqorkii Faaris oo Kuuros
ahaa ayaa wax loo muujiyey Daanyeel, oo magiciisa la
odhan jiray Beelteshaasar; waxaasuna run buu ahaa, oo
weliba dagaal weyn buu ahaa xaalkii wuu gartay, garashuuna
u lahaa wixii la tusay. 2 Waayahaas anigan Daanyeel ahu
saddex toddobaad oo dhan ayaan barooranayay. 3 Cunto
wanaagsan ma aan cunin, hilib iyo khamrina afkayga ma
gelin, mana subkan marnaba ilaa ay saddexdii toddobaad
dhammaadeen. 4 Oo bishii kowaad maalinteedii afar iyo
labaatanaad, anoo taagan webiga weyn oo Xiddeqel ah
agtiisa, 5 ayaan indhahayga kor u qaaday, oo wax fiiriyey,
markaasaan arkay nin dhar wanaagsan qaba, oo dahab
saafi ah oo Uufaas laga keenayaa dhexda ugu xidhan yahay;
6 jidhkiisuna wuxuu u ekaa berullos, wejigiisuna wuxuu u
ekaa hillaac, indhihiisuna waxay u ekaayeen laambado dab
ah, gacmihiisa iyo cagihiisuna waxay midabka uga ekaayeen
naxaas la safeeyey, codkiisuna wuxuu u ekaa dad faro
badan buuqood. 7 Oo anigaan Daanyeel ah oo keliya ayaa
wixii lay tusay arkay, waayo, nimankii ila socday ma ay arkin
wixii lay tusay, maxaa yeelay, aad bay u gariireen, wayna
carareen si ay u dhuuntaan. 8 Oo sidaasaa keligay layga
tegey, oo waxaan arkay waxan weyn ee lay tusay, oo xoogna
iguma hadhin, quruxdaydiina waxay u rogmatay qudhun,
markaasaan xoog iska waayay. 9 Oo codkiisiina waan
maqlay, oo markaan maqlay codkiisii ayaan hurdo culus
wejiga ula dhacay, wejigana dhulkaan saaray. 10 Oo bal eeg,
markaasaa gacanu i taabatay, oo jilbaha iyo calaacalaha
igu joojisay. 11 Oo wuxuu igu yidhi, Daanyeelow, ninka aad
loo jecelyahayow, bal garo erayada aan kugula hadlayo, oo
istaag, waayo, hadda adaa lay soo kaa diray, oo markuu
hadalkaas igula hadlay ayaan istaagay anigoo gariiraya.
12 Markaasuu igu yidhi, Ha cabsan, Daanyeelow, waayo,
maalintii ugu horraysay oo aad qalbigaaga gelisay inaad wax
garato oo aad isku hoosaysiiso Ilaah hortiis ayaa erayadaadii
la maqlay, oo anigu waxaan u imid erayadaadii aawadood.
13 Laakiinse boqortooyada Faaris amiirkeedii ayaa kow iyo
labaatan maalmood iga hor joogsaday, laakiinse Mikaa'iil, oo
ah amiirrada sare midkood, ayaa ii yimid inuu i caawiyo, oo
halkaasaan kula hadhay boqorradii reer Faaris. 14 Haddaba
waxaan u imid inaan ku ogeysiiyo waxa dadkaaga ku dhici
doona ugu dambaysta, waayo, wixii lagu tusay weli maalmo
badan baa ka hadhay. 15 Oo markuu igula hadlay erayada
sidan ah ayaan xagga dhulka u jeestay, waanan hadli kari
waayay. 16 Oo bal eeg, mid binu-aadmiga u ekaa ayaa
bushimahayga taabtay: markaasaan afka kala qaaday, oo
hadlay, oo waxaan ku idhi kii hor taagnaa, Sayidkaygiiyow,
riyada sababteeda aawadeed ayaa caloolxumadaydii igu soo
noqotay, xoogna waan iska waayay. 17 Anoo addoonkaaga
ahu sidee baan kuula hadli karaa, sayidkaygiiyow? Imminka
aniga xoog iguma hadhin, neefuna iguma jirto. 18 Markaasaa
haddana waxaa i taabtay mid binu-aadmiga u eg, wuuna i
xoogeeyey. 19 Markaasuu igu yidhi, Ninkii aad loo jeclaayow,
ha cabsan, nabadu ha kuu ahaato, xoog yeelo, oo xoog
yeelo. Oo markuu ila hadlay ayaan xoogaystay, oo waxaan
idhi, Sayidkaygiiyow, hadal, waayo, waad i xoogaysay. 20
Markaasuu igu yidhi, Haddaba ma og tahay waxa aan kuugu
imid wuxuu yahay? Oo hadda waxaan u noqonayaa inaan
la diriro amiirka reer Faaris, oo markaan tago waxaa iman
doona amiirkii dalka Gariigta. 21 Laakiinse waxaan kuu
sheegayaa waxa lagu qoray qorniinka runta; mana jiro mid
aniga kuwaas iga celiyaa, amiirkiinna Mikaa'iil mooyaane.

11 Daariyus oo reer Maaday ahaa, sannaddiisii kowaad
ayaan u istaagay inaan caawiyo oo xoogaysiiyo isaga.
2 Oo haatan runtaan kuu sheegayaa, Bal ogow, weliba
saddex boqor baa Faaris ka kici doonee, kan afraadna
kulligood waa ka wada maal badnaan doonaa, oo markuu
maalkiisa aad ugu xoogaysto, ayuu dhammaan boqortooyada
Gariigta ku kicin doonaa. 3 Oo waxaa kici doona boqor xoog

badan, oo talo weyn ku talin doona, hadba siduu doonayana
yeeli doonaa. 4 Oo markuu kaco, ayaa boqortooyadiisu
jabi doontaa, waxaana loo kala qaybin doonaa afarta jaho
oo samada, laakiin farcankiisa iyo sida dowladnimadiisu
ahayd toona looma qaybin doono, waayo, boqortooyadiisa
waa la rujin doonaa, oo waxaa yeelan doona kuwo kale
oo aan kuwan ahayn. 5 Oo boqorka koonfureed ayaa
xoog yeelan doona, oo mid amiirradiisa ka mid ah ayaa
ka sii xoog badnaan doona, wuxuuna yeelan doonaa
dowladnimo, oo dowladnimadiisuna waxay noqon doontaa
dowladnimo weyn. 6 Sannado dabadoodna way isku darsami
doonaan kulligood, oo boqorka koonfureed gabadhiisa ayaa
u iman doonta boqorka woqooyi inay heshiis la dhigato;
laakiinse gacanteedu xoog ma sii yeelan doonto; isaga iyo
gacantiisuna sii ma taagnaan doonaan, laakiinse waa la sii
dayn doonaa iyada, iyo kuwii keenay, iyo kii dhalay, iyo kii
waayahaas iyada xoogayn jirayba. 7 Laakiinse biqil ka baxay
jiriddii ay ka soo farcantay ayaa meeshiisa istaagi doona oo
u iman doona ciidanka, oo wuxuu soo geli doonaa boqorka
woqooyi qalcaddiisa, wuuna ka gees ahaan doonaa iyaga,
kolkaasuu ka adkaan doonaa. 8 Oo weliba wuxuu xagga
Masar qaadan doonaa ilaahyadooda, iyo sanamyadooda la
shubay, iyo weelashoodii wanaagsanaa ee laga sameeyey
lacagta iyo dahabka, oo intii dhawr sannadood ah ayuu ka
hadhi doonaa boqorka woqooyi. 9 Oo wuxuu iman doonaa
boqortooyada boqorka koonfureed, laakiin waddankiisuu ku
noqon doonaa. 10 Wiilashiisuna way dagaallami doonaan, oo
waxay urursan doonaan ciidan faro badan oo imanaya, oo
dhulka qarqinaya, oo dhex maraya, markaasuu soo noqon
doonaa oo la dagaallami doonaa ilaa qalcaddiisa. 11 Oo
boqorka koonfureed wuu cadhoon doonaa, kolkaasuu soo
bixi doonaa oo la dagaallami doonaa boqorka woqooyi,
oo wuxuu soo bixin doonaa dad faro badan, dadka faraha
badanna isagaa gacanta loo gelin doonaa. 12 Oo dadka
faraha badanna waa la qaadi doonaa, qalbigiisuna wuu
kibri doonaa; oo tobanyaal kun buu hoos u tuuri doonaa,
mase adkaan doono. 13 Oo markaasaa waxaa soo noqon
doona boqorkii woqooyi, oo wuxuu soo bixin doonaa dad
faro badan oo kuwii hore ka sii badan; oo sannado dabadood
wuxuu la iman doonaa ciidan badan iyo maal badan. 14 Oo
wakhtigaasna dad badan baa ka gees noqon doona boqorka
koonfureed; oo weliba kuwa wax dulma oo dadkaaga ku
dhex jira ayaa kici doona si ay riyadu u dhisanto; laakiinse
way dhici doonaan. 15 Sidaasuu boqorkii woqooyi u iman
doonaa, oo tuulmo buu tuuli doonaa, oo magaalo deyr
lehna wuu qaadan doonaa, ciidanka koonfureedna isma
hor taagi doonaan, iyo dadkiisa uu doortay toona, oo
xoog ay isku hor taagaanna ma jiri doono. 16 Laakiin kan
isaga ku kaca ayaa hadba siduu doonayo yeeli doona,
oo ninna isma hor taagi doono. Oo wuxuu dhex istaagi
doonaa dhulka quruxda leh, gacantiisana waxaa ku jiri
doona baabbi'in. 17 Inuu xoogga boqortooyadiisa oo dhan la
yimaado aawadeed ayuu wejigiisa u jeedin doonaa, waxaana
la jiri doona kuwa qumman, markaasuu siduu doonayo yeeli
doonaa; oo waxaa la siin doonaa gabadha dumarka si uu u
kharribo, laakiin ma ay istaagi doonto, tiisiina ma ay noqon
doonto. 18 Taas dabadeedna wuxuu u jeesan doonaa xagga
gasiiradaha, kuwo badanna wuu qaadan doonaa, laakiinse
mid amiir ah ayaa caydii uu caayay joojin doona; oo weliba
caydiisii isaguu ku celin doonaa. 19 Markaasuu haddana u
jeesan doona xagga qalcadaha waddankiisa, laakiinse wuu
turunturoon doonaa oo dhici doonaa, lamana heli doono.
20 Dabadeedna waxaa meeshiisii istaagi doona mid ka
dhigi doona in cashuurqaade boqortooyada ammaanteeda
dhex maro, laakiin dhawr maalmood dabadood ayaa la
jebin doonaa, lagumase jebin doono cadho ama dagaal.
21 Oo waxaa meeshiisii qaadan doona mid la quudhsado,
oo aan la siinin murwaddii boqortooyada, laakiin wuxuu
iman doonaa wakhtiga nabadgelyada, oo boqortooyadana
sasabashuu ku qaadan doonaa. 22 Oo iyaga hortiisa ayaa
laga xaaqi doonaa, sida daadku wax u qarqiyo oo kale,
waana la jebin doonaa iyagii, iyo weliba amiirkii axdigaba. 23
Oo markii wacad lala dhigto dabadeed ayuu si khiyaano
ah ku shaqaysan doonaa, waayo, dad yar buu la soo
bixi doonaa, wuuna xoog badnaan doonaa. 24 Wakhtiga
nabadgelyada ayuu iman doonaa xataa meelaha gobolka
ugu barwaaqo badan, markaasuu wuxuu samayn doonaa
wax aan awowayaashiis iyo abkowyadiis midkoodna samayn;
oo wuxuu ku dhex firdhin doonaa wax la boobay iyo dhac
iyo maal: oo intii wakhti ayuu wax qalcadaha ka gees ah ku
fikiri doonaa. 25 Markaasuu xooggiisa iyo geesinimadiisa
ku kicin doonaa boqorka koonfureed, isagoo ciidan badan
wata, boqorka koonfureedna isaguu la dagaallami doona
isagoo wata ciidan aad u xoog badan, laakiinse isma uu
taagi doono, maxaa yeelay, wax ka gees ah bay ku fikiri
doonaan. 26 Oo kuwii quudkiisii cunay ayaa jebin doona
isaga, oo ciidankiisuna dalkuu qarqin doonaa, oo kuwo
badan baa dhici doona iyagoo la laayay. 27 Oo labadaas
boqorba qalbiyadoodu waxay ka shaqayn doonaan belaayo,
oo miis keliya ayay been isugu sheegi doonaan; laakiinse
ma ay hagaagi doonto; waayo, weliba ugudambaystu waxay
noqon doontaa wakhtigii la xugmay. 28 Markaasuu dhulkiisii
ku noqon doonaa isagoo maal badan wata, qalbigiisuna
ka gees buu noqon doonaa axdiga quduuska ah; siduu

doonayo ayuu yeeli doonaa oo dhulkiisuu ku noqon doonaa.
29 Wakhtigii loo xugmay ayuu noqon doonaa oo koonfurtuu
iman doonaa; laakiinse wakhtiga ugu dambaysta ma noqon
doono sidii kii hore, 30 waayo, doonniyaha Kitiim ayaa
soo weerari doona; oo sidaas daraaddeed ayuu u quusan
doonaa, oo u noqon doonaa, oo wuxuu u cadhoon doonaa
axdiga quduuska ah oo siduu doonayo ayuu yeeli doonaa,
oo xataa wuu noqon doonaa, wuuna u fiirsan doonaa kuwa
ka taga axdiga quduuska ah. 31 Oo ciidan baa isaga la
gees noqon doona, oo waxay nijaasayn doonaan meesha
quduuska ah ee qalcadda leh, oo waxay qaadan doonaan
qurbaanka joogtada, oo waxay qotomin doonaan waxa baas
oo wax baabbi'iya. 32 Oo kuwa wax baas oo axdiga ka gees
ah sameeya ayuu sasabasho ku qalloocin doonaa; laakiinse
dadka Ilaahooda yaqaan way xoog badnaan doonaan, oo
waxyaalo waaweyn bay samayn doonaan. 33 Oo kuwa
xigmadda leh oo dadka ku dhex jira, kuwo badan bay wax
bari doonaan; laakiinse maalmo badan bay ku dhici doonaan
seef, iyo olol, iyo maxbuusnimo, iyo dhac. 34 Haddaba
markay dhacaan baa lagu caawin doonaa caawimaad yar,
laakiinse qaar badan baa iyagoo sasabanaya ku darsami
doona. 35 Oo qaarkooda xigmadda leh ayaa dhici doona,
si loo tijaabiyo, oo loo daahiriyo, oo loo caddeeyo, ilaa
wakhtiga ugudambaysta, maxaa yeelay, waa weli wakhtigii la
xugmay. 36 Oo boqorku siduu doonuu yeeli doonaa; wuuna
isa sarraysiin doonaa oo iska weynaysiin doonaa ilaah kasta,
oo waxyaalo yaab miidhan ah ayuu kaga hadli doonaa Ilaaha
ilaahyada, wuuna iska barwaaqoobi doonaa ilaa ay cadhadu
buuxsanto; waayo, wixii la goostay ayaa la samayn doonaa.
37 Umana fiirsan doono ilaahyadii awowayaashiis, ama
waxa dumarku jecel yihiin, oo ilaahna uma fiirsan doono,
waayo, wuu iska weynaysiin doonaa wax kasta. 38 Laakiinse
meeshiisuu ku cisayn doonaa ilaaha qalcadaha; oo ilaah
aanay awowayaashiis garanayn ayuu ku cisayn doonaa
dahab iyo lacag iyo dhagaxyo qaali ah, iyo waxyaalo fiican.
39 Oo ilaah qalaad caawimaaddiis ayuu wax ku samayn
doonaa qalcadaha ugu xoogga badan, oo mid kasta oo isaga
aqoonsada wuxuu u kordhin doonaa ammaan; wuxuuna
ka dhigi doonaa inay xukumaan kuwo badan, dhulkana
abaal buu ugu kala qaybin doonaa. 40 Wakhtiga ugu
dambaysta ayaa boqorka koonfureed la dagaallami doonaa
isaga, oo boqorka woqooyina wuxuu ugu iman doonaa
sida dabayl cirwareen ah, isagoo wata gaadhifardood, iyo
fardooley, iyo doonniyo badan, wuxuuna soo dhex geli
doonaa waddammada, wuuna qarqin doonaa, oo dhex mari
doonaa. 41 Wuxuu kaloo dhex geli doonaa dhulka quruxda
leh, oo waddammo badan oo kalena waa la afgembiyi
doonaa, laakiin waxaa gacantiisa laga samatabbixin doonaa
Edom, iyo Moo'aab, iyo kuwa waaweyn oo reer Cammoon.
42 Oo haddana gacantiisuu waddammada ku fidin doonaa,
oo dalka Masarna ma baxsan doono. 43 Laakiinse xoog
buu u yeelan doonaa khasnadaha dahabka iyo lacagta ah,
iyo waxyaalaha qaaliga ah ee Masar oo dhan. Oo weliba
dadka Liibiya, iyo dadka Itoobiyana tallaabooyinkiisay daba
geli doonaan. 44 Laakiinse warar bari iyo woqooyi ka yimid
ayaa ka welwelin doona isaga, markaasuu isagoo aad u
cadhaysan u soo bixi doonaa inuu kuwo badan baabbi'iyo
oo idleeyo. 45 Oo wuxuu teendhooyinkiisii boqornimo ka
taagi doonaa meel u dhaxaysa badda iyo buurta qurxoon oo
quduuska ah; laakiin mar buu dhammaadkiisu iman doonaa;
oo ninna ma caawin doono.

12 Oo wakhtigaas waxaa kici doona Mikaa'iil oo ah amiirka
weyn oo dadkaaga u kici doona, oo waxaa jiri doona
wakhti dhib badan, oo aan isagoo kale weli la arag intii
quruunu jirtay ilaa waagaas, oo wakhtigaas dadkaaga waa
la samatabbixin doonaa, mid kasta oo laga helo isagoo
ku qoran kitaabka. 2 Oo qaar badan oo ku hurda ciidda
dhulka ayaa soo toosi doona, qaarkood waxay u soo toosi
doonaan nolol weligeed ah, qaarkoodna waxay u soo toosi
doonaan ceeb iyo quudhsasho weligeed ah. 3 Oo kuwa
xigmadda lahu waxay u dhalaali doonaan sida nuurka
samada; kuwii kuwo badan xaqnimada u soo jeediyaana
sida xiddigaha weligood iyo weligood. 4 Laakiinse adigu
Daanyeelow, erayada xidh, kitaabkana shaabadee, ilaa
wakhtiga ugu dambaysta. Kuwo badan baa hore iyo dib u
roori doona, aqoontuna waa kordhi doontaa. 5 Markaasaan
anigoo Daanyeel ah wax fiiriyey, oo bal eeg, waxaan
arkay laba kale oo taagtaagan, mid wuxuu taagnaa webiga
qarkiisa soke, kan kalena wuxuu taagnaa webiga qarkiisa
shishe. 6 Oo mid baa ku yidhi ninkii dharka wanaagsan
qabay, oo biyaha webiga dushooda joogay, Ilaa goormuu
ahaan doonaa dhammaadka yaababkanu? 7 Oo waxaan
maqlay ninkii dharka wanaagsan qabay, oo biyaha webiga
dushooda joogay, markuu gacantiisii midig iyo gacantiisii
bidix samada u taagay oo ku dhaartay kan weligiis nool inay
noqon doonto wakhti iyo wakhtiyo iyo wakhti badhkiis; oo
markay dhammeeyaan jejebinta xoogga dadka quduuska
ah ayaa waxyaalahan oo dhammu dhammaan doonaan. 8
Oo anigu waan maqlay, mase garanin, markaasaan idhi,
Sayidkaygiiyow, waxyaalahan dhammaadkoodu muxuu
ahaan doonaa? 9 Markaasuu wuxuu igu yidhi, Daanyeelow,
iska tag, waayo, erayadii waa la xidhay oo la shaabadeeyey
ilaa wakhtiga ugu dambaysta. 10 Qaar badan baa isdaahirin
doona, oo iscaddayn doona, waana la tijaabin doonaa;

laakiinse kuwa sharka ahu sharnimay samayn doonaan; oo
inta sharka ah midkoodna wax ma garan doono, laakiinse
kuwa xigmadda leh ayaa wax garan doona. **11** Oo wakhtiga
qurbaanka joogtada ah la qaadi doono, ilaa la taagi doono
waxa baas oo wax baabbi'iya, waxaa jiri doona kun iyo laba
boqol iyo sagaashan maalmood. **12** Waxaa barakaysan ka
suga ee gaadha kunka iyo saddexda boqol iyo shan iyo
soddonka maalmood. **13** Laakiinse iska tag ilaa wakhtiga ugu
dambaystu ahaado, waayo, waad nasan doontaa, maalmaha
dabaadigoodana qaybtaadaad isu taagi doontaa.

# Hoosheeca

1 Kanu waa Eraygii Rabbiga oo u yimid Hoosheeca
ina Be'eeri wakhtigii dalka Yahuudah ay boqorrada ku
ahaayeen Cusiyaah, iyo Yootam, iyo Aaxaas, iyo Xisqiyaah,
iyo wakhtigii dalka Israa'iil uu boqorka ku ahaa Yaaraabcaam
ina Yoo'aash. 2 Rabbigu markuu Hoosheeca markii ugu
horraysay la hadlay, wuxuu Rabbigu Hoosheeca ku yidhi,
Tag, oo waxaad guursataa naag dhillo ah oo waxaad yeelataa
carruur dhillo dhashay, waayo, dadka dalku Rabbigay ka
fogaadaan sida naagu ninkeeda uga sinaysata. 3 Sidaas
daraaddeed wuu tegey oo wuxuu guursaday Gomer oo
ahayd ina Diblaayim, oo iyana way uuraysatay, oo wiil
bay isagii u dhashay. 4 Markaasaa Rabbigu isagii ku
yidhi, Magiciisa waxaad u bixisaa Yesreceel, waayo, in yar
dabadeed waxaan dhiiggii Yesreceel ka aar gudi doonaa
reerka Yeehuu, oo boqortooyada dadka Israa'iilna waan
joojin doonaa. 5 Oo maalintaas ayaan qaansada dadka
Israa'iil ku jebin doona dooxada Yesreceel. 6 Oo haddana
mar kalay uuraysatay oo gabadh bay dhashay. Markaasaa
Rabbigu wuxuu isagii ku yidhi, Waxaad magaceeda u bixisaa
Lo-Ruxaamaah, waayo, anigu mar dambe dadka Israa'iil u
naxariisan maayo, oo sinaba u saamixi maayo. 7 Laakiinse
waxaan u naxariisan doonaa dadka Yahuudah, oo waxaan
iyaga ku badbaadin doonaa Rabbiga Ilaahooda ah, oo kuma
badbaadin doono qaanso, ama seef, ama dagaal, ama fardo
iyo fardooley toona. 8 Oo haddana markii ay Lo-Ruxaamaah
naaskii ka gudhisay ayay uuraysatay, oo waxay dhashay
wiil. 9 Markaasaa Rabbigu isagii ku yidhi, Waxaad magiciisa
u bixisaa Lo-Cammii, waayo, idinku dadkayga ma ahidin,
oo aniguna Ilaahiin idiin ahaan maayo. 10 Laakiinse tirada
dadka Israa'iil waxay ahaan doontaa sida cammuudda badda
oo kale, taasoo aan la qiyaasi karin, lana tirin karin, oo
waxay noqon doontaa meeshii laga yidhi iyaga, Dadkayga
ma ahidin, waxaa laga odhan doonaa, Idinku waxaad tihiin
wiilashii Ilaaha nool. 11 Oo dadka Yahuudah iyo dadka
Israa'iilba waa laysu soo wada ururin doonaa, oo waxay
dooran doonaan mid madax iyaga u ah, oo dalkana way ka
bixi doonaan, waayo, maalinta Yesreceel maalin weyn bay
ahaan doontaa.

2 Waxaad wiilasha walaalihiinna ah ku tidhaahdaan,
Cammii, gabdhaha walaalihiinna ahna waxaad ku
tidhaahdaan, Ruxaamaah. 2 Hooyadiin barya, ee barya,
waayo, iyadu ma aha afadaydii, oo aniguna ma ahi
ninkeedii. Oo wejigeeda ha ka fogayso dhillanimadeeda,
oo sinadeedana ha ka fujiso naasaheeda dhexdooda, 3 si
aanan iyada u qaawin, oo aanan uga dhigin sidii maalintii
ay dhalatay, oo aanan uga dhigin sidii meel cidla ah, oo
aanan uga dhigin sidii dhul engegan, oo aanan harraad
ugu dilin. 4 Haah, oo carruurteeda uma aan naxariisan
doono, waayo, waa dhillo carruurteed. 5 Waayo, hooyadood
waa dhillowday, oo tii iyaga uuraysatay waxay samaysay
wax ceeb weyn ah, waayo, waxay tidhi, Anigu waan daba
gelayaa kuwa i caashaqa ee i siiya kibistayda iyo biyahayga,
iyo suufkayga, iyo waxayga linenka ah, iyo saliiddayda, iyo
cabniinkayga. 6 Haddaba bal eeg, anigu jidkaaga waxaan
ku awdi doonaa qodxan, oo deyr baan iyada hor dhigi
doonaa, si ayan dhabbaheedii u helin. 7 Oo iyana waxay
daba geli doontaa kuwa iyada caashaqi jiray, laakiinse
ma ay gaadhi doonto. Way doondooni doontaa, laakiinse
innaba ma ay heli doonto. Kolkaasay odhan doontaa,
Waxaan ku noqon doonaa ninkaygii hore, waayo, markaasaa
iiga roonayd siday haatan tahay. 8 Waayo, iyadu ma
ay ogayn inaan anigu siiyey hadhuudhka, iyo khamriga,
iyo saliidda, iyo inaan iyada ku badiyey lacag iyo dahab
ay iyagu Bacal ugu isticmaali jireen. 9 Haddaba sidaas
daraaddeed anigu hadhuudhkayga wakhtigiisa waan ceshan
doonaa, oo khamrigaygana xilligiisa waan ceshan doonaa,
oo suufkayga iyo waxayga linenka ah ee cawradeeda dedi
lahaana waan ka qaadi doonaa. 10 Oo haatan waxaan
soo bandhigi doonaa ceebteeda iyadoo ay u jeedaan kuwa
iyada caashaqi jiray, oo ninna iyada kama samatabbixin
doono gacantayda. 11 Oo weliba farxaddeeda oo dhanna
waan wada joojin doonaa, tan ciidaheeda, iyo bilaheeda
cusub, iyo sabtiyadeeda, iyo shirarkeedaba. 12 Oo waxaan
baabbi'in doonaa geedaheedii canabka ahaa iyo dhirteedii
berdaha ahayd oo ay iyadu tidhi, Kuwanu waa kiradaydii ay
kuwii i caashaqi jiray i siiyeen. Oo waxaan iyaga ka dhigi
doonaa duud, waxaana daaqi doona xayawaanka duurka.
13 Rabbigu wuxuu leeyahay, Waxaan iyada u taqsiiri doonaa
maalmihii ay fooxa Bacaliim u shidday, oo ay isku sharraxday
hilqadaheedii iyo dahabkeedii, oo ay daba gashay kuwii
iyada caashaqi jiray, anigase ay i illowday. 14 Haddaba bal
eeg, qalbigeedaan soo jiidi doonaa, oo cidladaan iyada keeni
doonaa, oo si qabow baan ula hadli doonaa. 15 Oo waxaan
iyada halkaas ka siin doonaa beeraheedii canabka ahaa,
oo dooxada Caakoorna waxaan uga dhigi doonaa albaab
rajo, oo iyana halkaasay ku jawaabi doontaa, sidii waagii ay
dhallintayarayd oo kale, iyo sidii maalintii ay dalkii Masar
ka soo baxday. 16 Oo waxay maalintaas noqon doontaa
inaad iigu yeedhid, Ninkaygiiyow, oo aadan mar dambe iigu
yeedhin, Bacalkaygiiyow, ayaa Rabbigu leeyahay. 17 Waayo,
afkeeda waan ka fogayn doonaa magacyada Bacaliimta,

iyana mar dambe magacooda lama soo qaadi doono. 18 Oo
maalintaas waxaan iyaga aawadood axdi ula dhigi doonaa
xayawaanka duurka, iyo haadda samada, iyo waxa dhulka
gurguurtaba, oo dalka dhexdiisa waan ka baabbi'in doonaa
qaansada iyo seefta iyo dagaalkaba, oo waxaan ka dhigi
doonaa inay si ammaan ah u jiifsadaan. 19 Oo waan ku
guursan doonaa inaad weligaaba tayda ahaatid. Haah, oo
waxaan kugu guursan doonaa xaqnimo, iyo caddaalad, iyo
raxmad, iyo naxariis. 20 Oo xataa waxaan kugu guursan
doonaa daacadnimo, oo adna Rabbigaad ogaan doontaa. 21
Oo waxay maalintaas noqon doontaa inaan jawaabo, ayaa
Rabbigu leeyahay. Waxaan u jawaabi doonaa samooyinka,
oo iyana waxay u jawaabi doonaan dhulka. 22 Oo dhulkuna
wuxuu u jawaabi doonaa hadhuudhka, iyo khamriga, iyo
saliidda, oo iyaguna waxay u jawaabi doonaan Yesreceel.
23 Oo anna dhulkaan iyada ku beeran doonaa, oo waan
u naxariisan doonaa tii aan naxariista heli jirin, oo kuwo
aan dadkayga ahaan jirin ayaan ku odhan doonaa, Idinku
dadkaygaad tihiin, oo iyana waxay igu odhan doonaan, Adna
waxaad tahay Ilaahayo.

3 Markaasaa Rabbigu igu yidhi, Haddana tag, oo waxaad
jeclaataa naag la caashaqo oo dhillo ah, sida Rabbigu u
jecel yahay dadka Israa'iil in kastoo ay ilaahyo kale u jeestaan,
oo ay jeclaadaan wax sabiib ah. 2 Sidaas daraaddeed
iyadaan ku soo iibsaday shan iyo toban xabbadood oo lacag
ah, iyo xomeer iyo badh oo shaciir ah. 3 Oo waxaan iyada ku
idhi, Waa inaad wakhti dheer ii joogtaa, oo aadan dhilloobin,
oo aadan innaba nin kale naagtiis noqon, oo aniguna sidaas
oo kalaan kuu ahaan doonaa. 4 Waayo, dadka Israa'iil
wakhti dheer bay joogi doonaan boqorla'aan, iyo amiirla'aan,
allabarila'aan, iyo tiirla'aan, eefodla'aan, iyo teraafiimla'aan.
5 Oo markaas dabadeedna dadka Israa'iil way soo noqon
doonaan, oo waxay doondooni doonaan Rabbiga Ilaahooda
ah, iyo Daa'uud oo boqorkooda ah, oo ugu dambaysta ayay
cabsi ula iman doonaan Rabbigooda iyo wanaaggiisa.

4 Dadka Israa'iilow, Rabbiga eraygiisa maqla, waayo,
Rabbigu dacwad buu la leeyahay dadka dalka deggan,
maxaa yeelay, dalka dhexdiisa laguma arko run, ama
naxariis, ama aqoonta Ilaah toona. 2 Innaba wax kale
laguma arko dhaarasho been ah, iyo axdijebin, iyo dilid,
iyo xadid, iyo sino mooyaane. Way soo fara baxsadaan, oo
dhiiggelid baa dhiiggelid ku xigsata. 3 Oo sidaas daraaddeed
ayaa dalku u barooran doonaa, oo mid kastoo dhexdiisa
degganuba waa macaluuli doonaa, oo xayawaanka duurka
iyo haadda samada, iyo xataa kalluunka badduna way wada
baabbi'i doonaan. 4 Laakiinse ninna yuusan murmin, oo
ninna yuusan mid kale canaanan, waayo, dadkaagu waa
sida kuwa wadaadka la murma. 5 Oo adna maalinnimo
waad turunturoon doontaa, oo habeennimona nebigu waa
kula turunturoon doonaa, oo anna hooyadaa waan baabbi'in
doonaa. 6 Dadkaygu waxay u baabba'aan aqoondarro
daraaddeed. Aqoonta aad diidday aawadeed ayaan adiga
kuu diidi doonaa, oo innaba wadaad ii ahaan maysid, maxaa
yeelay, waxaad illowday sharcigii Ilaahaaga, oo aniguna
waxaan illoobi doonaa carruurtaada. 7 Sidii ay u tarmeen si
le'eg ayay igu dembaabeen, haddaba sharaftoodii ayaan
ceeb u beddeli doonaa. 8 Iyagu waxay quutaan dembigii
dadkayga, wayna jeclaystaan xumaantoodii. 9 Oo waxay
ahaan doontaa in wadaadku noqdo sida dadka oo kale,
oo jidadkooda waan ciqaabi doonaa, oo falimahoodana
waan ka abaalmarin doonaa. 10 Wax bay cuni doonaan,
kamana dhergi doonaan, way sinaysan doonaan, mana tarmi
doonaan, maxaa yeelay, waxay ka tageen inay Rabbiga
dhegaystaan. 11 Sinada iyo khamriga iyo khamriga cusububa
qalbigay la tagaan. 12 Dadkaygu waxay talo weyddiistaan
waxooda qoriga ah, oo ushooduna wax bay u sheegtaa,
waayo, damaca sinada ayaa iyaga qalday, oo Ilaahoodii
way ka tageen sida naag ninkeeda ka dhillowda. 13 Waxay
allabari ku bixiyaan buuraha dhaladooda, oo foox bay ku
shidaan kuraha korkooda iyo geedaha alloon iyo libneh
iyo eelaah la yidhaahdo hoostooda, maxaa yeelay, waxay
leeyihiin hoos wanaagsan, haddaba gabdhihiinnu way
dhilloobaan oo aroosadihiinnuna way sinaystaan. 14 Anigu
ma aan ciqaabi doono gabdhihiinna markay dhilloobaan
amase aroosadihiinna markay sinaystaan, waayo, ragga
qudhooduba waxay raacaan dhillooyin, oo waxay allabari la
bixiyaan sharmuutooyin, oo dadkii aan wax garanaynna waa
la wada afgembiyi doonaa. 15 Dadka Israa'iilow, in kastoo
aad dhillowdaan, yaan dadka Yahuudah isla dembigaas
ku eedaysnaan, oo Gilgaal ha imanina, oo Beytaawen ha
tegin, hana ku dhaaranina Rabbiga noloshiisa. 16 Dadka
Israa'iil waxay u madax adkaadeen sidii qaalin lo'aad oo
madax adag. Haddaba Rabbigu miyuu iyaga u daajinayaa
sidii neef baraar ah oo berrin bannaan jooga? 17 Reer
Efrayim wuxuu raacay sanamyo, haddaba iska daa. 18
Cabniinkoodii waa dhanaanaaday. Had iyo goorba way
sinaystaan. Taliyayaashooduna aad bay ceebta u jecel,
yihiin. 19 Dabayshu waxay iyaga ku soo duudduubtay
baallaheedii, oo iyana allabaryadooda ayay u ceeboobi
doonaan.

5 Wadaaddadow, tan maqla, oo dadka Israa'iilow,
dhegaysta, oo reerka boqorkow, dhegta u dhiga, waayo,

xukun baa idinku dhacaya, maxaa yeelay, waxaad ahaydeen
dabin Misfaah ku yaal, iyo shabag Buur Taaboor ku
kala fidsan. 2 Oo caasiyiintii aad iyo aad bay layntii
ugu dheeraadeen, aniguse kan dhammaantood canaanta
baan ahay. 3 Anigu waan aqaan reer Efrayim, dadka
Israa'iilna igama qarsoona, waayo, haatan reer Efrayimow,
waad sinaysateen, dadka Israa'iilna way nijaasoobeen. 4
Falimahoodu u oggolaan maayaan inay Ilaahoodii ku soo
noqdaan, waayo, damaca sinadu waa ku dhex jiraa, oo
Rabbiga ma ay yaqaaniin. 5 Waxaa dadka Israa'iil ku
marag fura kibirkooda, haddaba dadka Israa'iil iyo reer
Efrayimba waxay ku turunturoon doonaan xumaantooda,
dadka Yahuudahna way la turunturoon doonaan iyaga. 6
Waxay kaxayn doonaan adhyahooda iyo ishkinkooda iyagoo
Rabbiga doondoonaya, laakiinse isaga ma ay heli doonaan,
waayo, wuu ka noqday iyaga. 7 Rabbiga khiyaano ayay kula
macaamiloodeen, waayo, waxay dhaleen carruur garacyo ah,
haddaba bil baa lagu baabbi'in doonaa iyaga iyo waxoodaba.
8 War buunka Gibecaah ka afuufa, turumbadana Raamaah,
oo Beytaawen ka dhawaaqa. Reer Benyaamiinow, waa laydin
daba socdaa. 9 Dalka reer Efrayim wuxuu ahaan doonaa
meel cidlo ah maalinta canaanta. Waxaan qabiilooyinka
reer binu Israa'iil dhexdooda ka ogeysiiyey waxa xaqiiqa
ahaan u dhici doona. 10 Amiirrada dalka Yahuudah waxay la
mid yihiin kuwa durkiya calaamada soohdinta. Cadhadayda
ayaan ugu dul shubi doonaa sida biyaha oo kale. 11 Reer
Efrayim waa la dulmay, oo xukun baa lagu burburiyey,
waayo, raalli bay ku ahaayeen inay amarka daba socdaan.
12 Haddaba sidaas daraaddeed reer Efrayim waxaan u ahay
sida balanbaallista oo kale, oo dadka Yahuudahna waxaan u
ahay sida waxa qudhmay oo kale. 13 Reer Efrayim markuu
arkay cudurkiisa, oo dadka Yahuudahna ay dhaawacooda
arkeen, markaasaa reer Efrayim wuxuu tegey dalka Ashuur,
oo wuxuu u cid dirsaday Boqor Yaareeb. Laakiinse isagu ma
awoodo inuu ku bogsiiyo, oo dhaawacaaga kaa dawayn
maayo. 14 Waayo, waxaan reer Efrayim ku noqon doonaa
sidii aar libaax oo kale, oo dadka Yahuudahna waxaan ku
noqon doonaa sidii aaran libaax oo kale. Anigu qudhayda
ayaa jeexjeexan doona oo bixi doona, waan la tegi doonaa,
oo mid iga samatabbixiyaana ma jiri doono. 15 Anigu waan
tegi doonaa oo waxaan ku noqon doonaa meeshaydii, jeeray
iyagu xumaantooda qirtaan oo ay i doondoonaan. Iyagoo
cidhiidhi ku dhex jira ayay aad ii doondooni doonaan.

**6** Ina keena aan Rabbiga ku noqonnee, waayo, isagaa
ina dillacshay, oo isagaa ina bogsiin doona, isagaa
wax inagu dhuftay, oo isagaa nabraheenna inoo duubi
doona. 2 Laba maalmood dabadeed ayuu ina soo noolayn
doonaa, oo maalinta saddexaadna wuu ina soo sara kicin
doonaa, oo hortiisaynu ku noolaan doonnaa. 3 Oo aynu
ogaanno, oo aynu dadaalno inaan Rabbiga ogaanno.
Soobixitinkiisa sida subaxda baa loo hubaa, oo wuxuu inoogu
iman doonaa sida roobka, sida roobka dambe oo dhulka
biyeeya. 4 Reer Efrayimow, bal maxaan idinku sameeyaa?
Dadka Yahuudahow, bal maxaan idinku sameeyaa? Waayo,
wanaaggiinnu waa sida daruurta subaxnimo, iyo sida sayaxa
aroor hore baabba'a. 5 Sidaas daraaddeed waxaan iyaga ku
gooyay gacantii nebiyada, oo waxaan ku laayay erayadii
afkayga, oo xukummadayduna waa sidii iftiinka soo baxa.
6 Waayo, waxaan doonayaa naxariis ee ma aha allabari,
oo aqoonta Ilaahna waan ka jeclahay qurbaanno la gubo.
7 Laakiinse iyagu sidii Aadan oo kale ayay axdigii ku
xadgudbeen, oo halkaasay khiyaano iigula macaamiloodeen.
8 Gilecaad waa magaalada kuwa xumaanta ka shaqeeya,
oo dhiig baa wasakheeyey. 9 Oo sidii guutooyin shufta
ahu ay nin ugu gabbadaan ayaa guuto wadaaddo ahu
dhiig ku daadisaa jidka u baxa Shekem, oo wasakhnimo
bay sameeyeen. 10 Dadka Israa'iil waxaan ku dhex arkay
wax aad iyo aad u xun. Reer Efrayim waxaa laga dhex
helay sino, dadka Israa'iilna way nijaasoobeen. 11 Dadka
Yahuudahow, markaan dadkayga maxaabiisnimada ka soo
celiyo, beergoosasho laydiin amray baa idiin taal.

**7** Haddaba markii aan damco inaan dadka Israa'iil bogsiiyo
ayaa waxaa la soo bandhigaa xumaantii reer Efrayim, iyo
sharnimadii dadka Samaariya, waayo, waxay sameeyaan
wax been ah, oo tuuggiina guduhuu galaa, guutada shuftada
ahuna dibadday wax ka dhacaan. 2 Oo qalbiga kagama
ay fikiraan inaan xumaantooda oo dhan xusuusto. Haatan
waxaa iyagii dhinacyada ka hareereeyey falimahoodii, oo
way i hor yaallaan. 3 Waxay boqorka kaga farxiyaan
xumaantooda, oo amiirradana beentooda. 4 Dhammaantood
waa dhillayo, oo waa sida foorno uu kibisdubuhu kululeeya
oo dabka ololintiisa joojiyaa uun markuu cajiinka cajiimayo
ilaa uu cajiinku khamiiro. 5 Maalinta boqorkayaga amiirradu
way isku bukaysiiyeen kulaylka khamriga, isagu wuxuu
gacanta u taagay kuwo wax quudhsada. 6 Waayo, iyagu
waxay qalbigoodii u diyaariyeen sidii foorno oo kale intii
ay wax u gabbanayeen, oo kibisdubahoodiina wuu hurdaa
habeenkii oo dhan, oo aroortiina qalbigu waa u qaxmayaa
sida dab ololaya oo kale. 7 Iyagu dhammaantood waxay
u kulul yihiin sida foorno oo kale, oo waxay baabbi'iyaan
xaakinnadooda, oo boqorradii oo dhammuna waxay yihiin
kuwa dhacay, oo dhexdooda lagama arko innaba mid i barya.

8 Reer Efrayim dadyowguu isku dhex qasaa, reer Efrayim
waa sida kibis aan la wada dubin. 9 Shisheeyayaal ayaa
xooggiisa dhammeeyey, oo isna maba oga. Xataa cirraa ka
soo baxday, oo isna maba oga. 10 Waxaa dadka Israa'iil ku
marag fura kibirkooda, laakiinse iyagu uma ay soo noqon
Rabbiga Ilaahooda ah, mana ay doondoonin isaga in kastoo
ay waxyaalahaa oo dhan sameeyeen. 11 Reer Efrayim waa
sida qoolley doqon ah oo aan waxgarasho lahayn, waayo,
iyagu waxay u yeedhaan Masar oo waxay tagaan dalka
Ashuur. 12 Markay tagaan waxaan ku kor fidin doonaa
shabaggayga, oo iyagaan u soo dejin doonaa sida haadda
samada, oo sidii ururkoodu maqlay ayaan iyaga u edbin
doonaa. 13 Iyagaa iska hoogay, waayo, way iga ambadeen!
Halaag ha ku dhaco, waayo, way igu xadgudbeen! In kastoo
aan iyaga soo furan lahaa haddana been bay iga sheegeen.
14 Oo qalbigooda igama ay baryin, laakiinse sariirahooday
ku kor ooyaan. Waxay u soo wada shiraan hadhuudh iyo
khamri aawadood, oo anigana way igu caasiyoobaan. 15
In kastoo aan wax baray oo aan gacmahooda xoogeeyey,
ayay weliba shar ii fikiraan. 16 Way soo noqdaan, laakiinse
uma ay soo noqdaan kan sarreeya. Iyagu waa sida qaanso
khiyaano badan oo kale. Amiirradooduna seef bay ku le'an
doonaan cadhada carrabkooda daraaddeed. Tanu waxay
dalka Masar ku noqon doontaa wax iyaga lagu quudhsado.

8 Buunka afkaaga saar. Cadowgu sidii gorgor buu
u imanayaa guriga Rabbiga, maxaa yeelay, dadku
axdigaygay jebiyeen, oo sharcigaygiina way ku xadgudbeen.
2 Way ii qayshan doonaan, iyagoo leh, Ilaahayow, annagoo
dadka Israa'iil ahu waannu ku naqaan. 3 Dadka Israa'iil way
iska xooreen wixii wanaagsanaa, oo iyaga cadowgu waa
eryan doonaa. 4 Boqorray boqradeen, laakiinse iyagu ma
aha kuwa aan amray, waxayna doorteen amiirro laakiinse
anigu ma aan aqoonsan. Lacagtoodii iyo dahabkoodiiba
ayay sanamyo ka samaysteen, oo sidaas darteed ayaa loo
baabbi'in doonaa. 5 Samaariyey, weyshaadii wuu diiday
isagoo leh, Cadhadaydii aad bay ugu kululaatay iyaga. Ilaa
goormayan karayn inay daahir noqdaan? 6 Waayo, xataa
dadka Israa'iil ayaa kanu ka yimid, oo nin saanac ahu baa
sameeyey, oo Ilaah ma aha. Hubaal weysha Samaariya waa
la burburin doonaa. 7 Waayo, waxay beertaan dabaysha,
oo dabaysha cirwareenta ah ayay soo goosan doonaan.
Hadhuudh taagan ma leh, baalkuna midho ma dhali doono,
oo hadduu dhalona, shisheeyaa cuni doona. 8 Dadka
Israa'iil waa la liqay, oo haatan waxay quruumaha u dhex
joogaan sidii weel aan la doonayn. 9 Waayo, iyagu waxay
u keceen dalka Ashuur, oo waa sidii dameer banjoog ah
oo keligiis jooga. Reer Efrayim waxay soo kiraysteen kuwa
caashaqa. 10 In kastoo ay quruumaha dhexdooda dad ka
soo kiraystaan, haatan waan soo ururin doonaa iyaga, oo
waxay bilaabayaan inay la yaraadaan sabab ka kacday
culaabtii uu boqorkii amiirradu iyaga saaray. 11 Reer Efrayim
waxay badiyeen meelo allabari, wayna ku dembaabeen,
oo sidaas daraaddeed meelaha allabarigu waxay iyaga u
noqdeen wax iyaga dembaajiya. 12 In kastoo aan iyaga
u qoraa kumanyaalka amar ee sharcigayga, haddana
waxaa lagu tiriyaa sida wax qalaad oo kale. 13 Oo weliba
allabaryadii qurbaannadayda ahaana waxay ku allabaryaan
hilib, wayna iska cunaan, laakiinse Rabbigu iyaga ma
aqbalo. Haatan wuu soo xusuusan doonaa xumaantoodii,
oo dembiyadoodiina wuu ciqaabi doonaa, oo Masar bay
ku noqon doonaan. 14 Waayo, dadka Israa'iil Abuurahoodii
way illoobeen, oo waxay dhisteen daaro waaweyn, dadka
Yahuudahna magaalooyin deyr leh aad bay u badsadeen,
laakiinse anigu magaalooyinkooda ayaan dab ku soo dul
dayn doonaa, oo wuxuu wada gubi doonaa daarahooda
waaweyn oo dhan.

9 Dadka Israa'iilow, farxad ha ku rayraynina sida dadyowga,
waayo, waxaad ka tagteen Ilaahiinnii sida naag ninkeeda
ka dhillowday, oo waxaad aad u jeclaateen inaad caashaq
lacag ku kiraysataan goob kasta oo hadhuudh. 2 Goobta
hadhuudhka lagu tumo iyo macsarada khamriguba iyaga ma
ay quudin doonaan, oo khamriga cusubuna wuu gabi doonaa.
3 Iyagu ma ay degganaan doonaan Rabbiga dalkiisa,
laakiinse reer Efrayim Masar bay ku noqon doonaan, oo
cunto wasakh ah ayay ku dhex cuni doonaan dalka Ashuur.
4 Iyagu Rabbiga uma ay shubi doonaan qurbaanno khamri
ah, oo isagana kama ay farxin doonaan. Allabaryadoodu
waxay iyaga ula mid noqon doonaan sida cuntada kuwa
baroorta. In alla intii wax ka cuntaana way wada nijaasoobi
doonaan, waayo, cuntadoodu waxay ahaan doontaa mid ay
nafsadoodu u hamuunta, oo sooma ay geli doonto guriga
Rabbiga. 5 Bal maxaad samayn doontaan maalinta shirka
weyn, iyo maalinta iidda Rabbigaba? 6 Waayo, bal eeg,
iyagu waxay ka tageen halligaad, laakiinse Masar baa
iyaga soo ururisan doonta, oo waxaa iyaga aasi doonta
magaalada Mof. Waxyaalahooda wacan oo lacagta ahna
waxaa qaadan doona maraboob, oo teendhooyinkoodana
waxaa ka soo dhex bixi doonta qodxan. 7 Maalmihii
ciqaabiddu waa yimaadeen, oo maalmihii abaalmarintu waa
yimaadeen. Dadka Israa'iilna way ogaan doonaan. Nebigu
waa nacas, ninkii ruuxa lahuna waa waalan yahay, waana
xumaantaada badatay aawadeed, iyo cadownimada badatay

aawadeed. 8 Reer Efrayim wuxuu ahaa waardiye Ilaahay la
jira, laakiinse nebigii jidadkiisa oo dhan waxaa loo dhigay
dabinkii shimbirrodabadka, oo gurigii Ilaahiisna cadownimo
baa ku jirta. 9 Iyagu aad bay isu kharribeen sidii wakhtigii
Gibecaah. Isagaa soo xusuusan doona xumaantooda oo
wuxuu soo ciqaabi doonaa dembiyadooda. 10 Waxaan
gartay in dadka Israa'iil ay la mid ahaayeen canab cidlada
ku dhex yaal, oo waxaan arkay in awowayaashiin ahaayeen
sidii berdaha xilliga hore bislaada, laakiinse iyagu waxay
yimaadeen Bacal Fecoor, oo waxay gooni isugu sooceen
waxaas ceebta miidhan ah, oo waxay u karaahiyoobeen sidii
wixii ay jeclaayeen oo kale. 11 Oo weliba reer Efrayimna
sharaftoodu waxay u haadi doontaa sidii shimbir oo kale, oo
innaba dhalasho, iyo uuraysi, iyo wallacid ma jiri doonaan.
12 In kastoo ay carruurtooda koriyaan haddana waan
gablamin doonaa si aan ninna u hadhin aawadeed, oo
weliba iyagaa iska hoogay markii aan ka tago! 13 Sidii
aan Turos u arkay ayaa reer Efrayim meel wacan lagu
beeray, laakiinse reer Efrayim wuxuu carruurtiisa u soo
bixin doonaa kan wax laaya. 14 Rabbiyow, iyaga wax sii.
Maxaad siin doontaa iyaga? Waxaad siisaa maxal dhiciya
iyo naaso gudhay. 15 Xumaantoodii oo dhammu waxay ku
jirtaa Gilgaal, waayo, iyaga halkaas baan ku necbaaday.
Haddaba xumaanta falimahooda aawadeed ayaan iyaga
uga eryi doonaa gurigayga. Mar dambe ma aan jeclaan
doono, waayo, amiirradooda oo dhammu waa caasiyiin.
16 Reer Efrayim wax baa lagu dhuftay, xididkoodiina waa
qallalay, oo innaba midho ma ay dhali doonaan! Oo xataa in
kastoo ay wax dhalaan, haddana waan wada layn doonaa
midhaha ay jecel yihiin oo maxalkooda. 17 Ilaahay waa
xoori doonaa, maxaa yeelay, codkiisii ma ay dhegaysan,
oo waxay quruumaha dhexdooda ku ahaan doonaan kuwa
warwareega.

**10** Dadka Israa'iil waa geed canab ah oo barwaaqaysan,
kaasoo midhihiisa soo bixiya, oo sida midhihiisu u
bateen ayuu meelihiisa allabariga u badiyey, oo sida dalkiisu
u barwaaqaysan yahay ayay u samaysteen tiirar qurqurxoon.
2 Qalbigoodu waa kala qaybsan yahay, oo haatan waxaa
lagu heli doonaa gardarro. Meelahooda allabariga ayuu
wax ku dhufan doonaa, oo tiirarkoodana wuu wada kharribi
doonaa. 3 Sida xaqiiqada ah hadda waxay odhan doonaan,
Annagu boqor ma lihin, waayo, Rabbiga kama cabsanno,
haddaba bal maxaa boqor noo taraya? 4 Waxay ku hadlaan
erayo aan waxba ahayn, iyagoo si been ah ugu dhaaranaya
markay axdiyo gelayaan. Sidaas daraaddeed xukunku wuxuu
u soo bixi doonaa sidii dacarmariid ka soo baxa beerta
jeexjeexeeda. 5 Dadka dalka Samaariya degganu aad bay u
cabsan doonaan sanamyada weylaha ah ee Beytaawen
aawadood, waayo, dadkiisa iyo weliba wadaaddadii ku
rayrayn jiray way u barooran doonaan sanamka, waana
sharaftiisii aawadeed, maxaa yeelay, way ka tagtay. 6 Oo
weliba sanamkii waxaa loo qaadi doonaa dalka Ashuur inuu
Boqor Yaareeb gabbaro u noqdo aawadeed. Reer Efrayim
wuxuu heli doonaa ceeb, oo dadka Israa'iilna waxay ka
ceeboobi doonaan taladooda. 7 Oo weliba Samaariyana
boqorkeedii wuxuu u baabba'ay sida xumbada biyaha dul
sabbayso. 8 Oo weliba meelaha sare ee Aawen ku yaal oo
dembiga dadka Israa'iil ahna waa la wada dumin doonaa.
Meelahooda allabarigana waxaa ka soo kor bixi doona
qodxan iyo yamaarug. Waxay buuraha ku odhan doonaan,
War na qariya. Oo gumburahana waxay ku odhan doonaan,
Nagu soo dhaca. 9 Dadka Israa'iilow, tan iyo wakhtigii
Gibecaah waad dembaabayseen. Halkaasay istaagaan si
aan dagaalkii lala dagaallamay carruurta dembigu Gibecaah
u gaadhin. 10 Markaan damco ayaan iyaga edbin doonaa,
oo dadyowga ayaa isugu soo wada ururi doona iyaga,
markii loo xidho labadoodii xadgudub aawadood. 11 Oo
reer Efrayim waa sidii qaalin lo'aad oo la tababbaray,
taasoo jecel inay hadhuudhka ku tumato, laakiinse anigu
waan u tudhay surkeedii qurxoonaa. Reer Efrayim waxaan
korkooda saari doonaa mid iyaga fuula. Dadka Yahuudah
dhulkay jeexi doonaan, reer Yacquubna waxay burburin
doonaan ciidda qallalan. 12 Nafsaddiinna xaqnimo wax
ugu beerta, oo si naxariista waafaqsan wax u goosta, oo
jabsada dhulkiinna jeexan, waayo, waa wakhti ku habboon
in Rabbiga la doondoona, ilaa uu yimaado oo uu xaqnimo
idinku soo dejiyo. 13 Waxaad falateen sharnimo, waxaad
soo goosateen xumaan, oo waxaad cunteen midhihii beenta,
waayo, waxaad isku hallayseen jidkiinna iyo raggiinna tirada
iyo xoogga badan. 14 Haddaba sidaas daraaddeed buuq baa
dadkiinna ka dhex kici doona, oo qalcadihiinna oo dhanna
waxaa loo wada baabbi'in doonaa sidii Shalman Beytarbeel
maalintii dagaalka u baabbi'iyey oo kale. Hooyada iyo
carruurteediiba ayaa dhulka lagu tuuray. 15 Sidaas oo kalaa
Beytel laydinkaga samayn doonaa, waana sharnimadiinna
weyn daraaddeed. Markii waagu beryo ayaa boqorka dalka
Israa'iil dhammaantiis la baabbi'in doonaa.

**11** Markii Israa'iil ilmo yar ahaa waan jeclaan jiray, oo
wiilkaygii Israa'iil waxaan uga yeedhay dalka Masar.
2 Sidii loogu yeedhay ayay iyagii uga fogaadeen. Waxay
allabari u bixiyeen Bacaliim, oo foox bay u shideen sanamyo
xardhan. 3 Oo weliba reer Efrayim waan socod baray, oo

gacmahaygaan ku xambaaray, laakiinse iyagu ma ay ogayn
inaan bogsiiyey iyaga. **4** Waxaan iyaga ku soo jiiday dad
xadhkihiis iyo jacayl xidhmihiis, oo waxaan u ahaa sidii kuwa
daamankooda harqoodka ka dejiya, oo waxaan hortooda
dhigay cunto. **5** Iyagu kuma noqon doonaan dalkii Masar,
laakiinse waxaa boqor u noqon doona kii reer Ashuur,
maxaa yeelay, iyagu way diideen inay noqdaan. **6** Oo seef
baa waxay ku dhici doontaa magaalooyinkooda, oo waxay
baabbi'in doontaa qataarradooda, oo way wada dhammayn
doontaa iyaga, waana taladooda daraaddeed. **7** Dadkaygii
waxay ku tashadeen inay dib iga noqdaan. In kastoo iyaga
loogu yeedhay Kan ugu sarreeya, innaba midnaba isaga ma
sarraysiin doono. **8** Reer Efrayimow, sidee baan idiin sii dayn
karaa? Dadka Israa'iilow, sidee baan idiin gacangelin karaa?
Sidee baan idiinka dhigi karaa sidii Admaah? Oo sidee baan
idiinka dhigi karaa sidii Seboyim? Qalbigaygii wuu igu dhex
rogmadaa oo naxariis buu la dhaqaaqaa. **9** Anigu soo dayn
maayo kulaylka cadhadayda, oo u soo noqon maayo inaan
reer Efrayim baabbi'iyo, waayo, waxaan ahay Ilaah, oo qof
aadmi ah ma ihi. Anigu dhexdiinna waxaan ku ahay Kan
Quduuska ah, oo magaalada cadho la geli maayo. **10** Iyagu
waxay daba geli doonaan Rabbiga oo sidii libaax buu u ciyi
doonaa, Markuu ciyo ilmihiisu xagga galbeed bay ka iman
doonaan iyagoo gariiraya. **11** Waxay iyagoo gariiraya u iman
doonaan sidii shimbir Masar ka soo baxday, iyo sidii qoolley
ka soo baxday dalka Ashuur, oo anigu waxaan iyaga ka
dhigi doonaa inay guryahooda iska degganaadaan, ayaa
Rabbigu leeyahay. **12** Reer Efrayim waxay igu hareereeyaan
been oo waxaa dadka Israa'iil igu hareereeyaan khiyaano,
laakiinse dadka Yahuudah weli Ilaah bay wax la xukumaan,
oo Kan Quduuska ah ayay daacad u yihiin.

**12** Reer Efrayim waxay quutaan dabayl oo waxay daba
galaan dabaysha bari. Had iyo goorba been iyo baabba'
bay badiyaan, oo waxay axdi la dhigtaan dadka dalka
Ashuur, saliidna Masar bay u qaadaan. **2** Oo weliba Rabbigu
dacwad buu la leeyahay dadka Yahuudah, oo wuxuu reer
Yacquub u ciqaabi doonaa si waafaqsan jidadkooda, oo
wuxuu u abaalmarin doonaa si waafaqsan falimahooda. **3**
Yacquub markuu uurka ku jiray walaalkiis buu cedhibta ku
dhegay, oo markuu nin noqdayna Ilaah buu la dagaallamay.
**4** Haah, oo wuxuu la dagaallamay malaa'igtii, wuuna ka
adkaaday, wuuna ooyay oo baryay. Wuxuu isagii ka helay
Beytel, oo halkaasuu nagula hadlay. **5** Rabbigu waa Ilaaha
ciidammada. Rabbigu waa magiciisa lagu xusuusto. **6**
Haddaba sidaas daraaddeed Ilaahaaga u soo jeeso, oo
naxariista iyo garsooridda xaji, oo had iyo goorna Ilaahaaga
sug. **7** Dadkaygu waa baayacmushtari, oo waxaa gacanta
ugu jira kafadihii khiyaanada, waxay jecel yihiin inay wax
dulmaan. **8** Oo reer Efrayim wuxuu yidhi, Sida xaqiiqada
ah taajir baan noqday, oo maal baan helay, oo innaba
hawlahayga oo dhan lagama heli doono xumaan dembi
ah. **9** Laakiinse anigu waxaan ahay Rabbiga Ilaahiinna ah
oo idinka soo bixiyey dalkii Masar, oo weliba waxaan ka
dhigi doonaa inaad mar kale teendhooyin degganaataan sidii
wakhtigii iidda. **10** Oo weliba waxaan la hadlay nebiyadii,
oo waxaan badiyey waxyaalo aan tusay, oo nebiyadana
waxaan u soo dhiibay masaalooyin. **11** Reer Gilecaad waa
xumaan miidhan oo iyagu dhammaantood waa wax aan
waxtar lahayn. Waxay Gilgaal ku allabaryaan dibiyo, oo
weliba meelahooda allabarigu waa sida tuulmooyin ku dhex
yaal jeexjeexyada beerta oo kale. **12** Yacquub wuxuu ku
dhex cararay beertii Aram, oo Israa'iil inuu naag helo buu
u shaqeeyey oo ido u ilaaliyey. **13** Oo Rabbigu reer binu
Israa'iil nebi buu kaga soo bixiyey dalkii Masar, oo nebi
baa iyagii lagu ilaashay. **14** Reer Efrayim si qadhaadh bay
Rabbiga uga xanaajiyeen, haddaba dhiiggoodu korkooduu
ku hadhi doonaa, oo ceebtoodana Sayidkoodu waa ku soo
celin doonaa.

**13** Markii reer Efrayim hadleen waxaa jiray gariir, oo
dalka Israa'iil ayay isku dhex sarraysiiyeen, laakiinse
markay Bacal ku gardarnaadeen ayay dhinteen. **2** Oo
haatan aad bay u sii dembaabaan, oo waxay lacagtooda
ka samaysteen taswiiro la shubay kuwaasoo ah xataa
sanamyo ay u samaysteen sida ay waxgarashadoodu
tahay, oo dhammaantoodna waxaa weeye nin saanac
ah sancadiis, oo waxay ka sheegaan, Dadka allabariga
bixiya weylaha sanamyada ah ha dhunkadeen. **3** Haddaba
sidaas daraaddeed waxay noqon doonaan sida daruurta
subaxnimo, iyo sida sayaxa aroor hore baabba'a, iyo sida
buunshaha dabayshu ka kaxayso goobta hadhuudhka
lagu tumo, iyo sida qiiqa sholadda ka baxa. **4** Laakiinse
anigu waxaan ahay Rabbiga Ilaahiinna ah oo idinka soo
bixiyey dalkii Masar, oo waa inaydaan aqoonsan ilaah
kale aniga mooyaane, oo badbaadiye kale ma jiro innaba
aniga mooyaane. **5** Anigu waan idin iqiin markii aad dhex
joogteen cidladii ahayd dalka abaarta badan. **6** Markii ay wax
daaqeen ayay dhergeen, oo markay dhergeen dabadeed
ayaa qalbigoodii kor u kacay, haddaba sidaas daraaddeed
bay ii illoobeen. **7** Sidaas daraaddeed waxaan iyaga ku
ahay sida libaax oo kale, oo sida shabeel ayaan jidka
ku ag dhawri doonaa. **8** Oo waxaan iyaga uga hor iman
doonaa sida orso gabneheedii laga gablamiyey, oo waxaan

jeexjeexi doonaa xuubkii wadnahooda, oo halkaasaan iyaga
ku baabbi'in doonaa sidii gool libaax oo kale, oo waxaa
iyaga dildillaacsan doona dugaagga. **9** Dadka Israa'iilow,
baabbi'inna waxaa sabab u ah cadownimada aad ii qabtaan
anoo caawiyihiinna ah. **10** Haddaba magaalooyinkiinna oo
dhan ha idinku badbaadiyee meeh boqorkiinnii? Oo meeye
xaakinnadiinnii aad ka tidhaahdeen, Na sii boqor iyo amiirro?
**11** Anigoo xanaaqsan ayaan boqor idin siiyey, oo haddana
anigoo cadhaysan ayaan idinka qaaday. **12** Xumaantii reer
Efrayim waa xidhxidhan tahay, oo dembigoodiina meel baa
lagu kaydiyey. **13** Oo waxaa iyaga ku soo kor degi doonta
murugtii naag foolanaysa. Iyagu waa sida wiil aan caqli
lahayn, waayo, haatan waa wakhtigii uusan ku sii raagin
meeshii carruurtu ka soo dhalan jireen. **14** Anigu waxaan
iyaga ka soo furan doonaa xoogga She'oolka, oo waxaan ka
soo badbaadin doonaa dhimashada. Dhimashoy, meeye
belaayooyinkaagii? She'oolow, meeday baabbi'intaadii?
Toobaddu indhahayga way ka qarsoonaan doontaa. **(Sheol
h7585)** **15** In kastoo uu walaalihiis dhexdooda ku dhal badan
yahay, waxaa iman doonta dabayl bari ka timid, taasoo
ah neefta Rabbiga oo cidlada ka soo baxaysa, oo ishiisa
biyood way engegi doontaa, oo durdurkiisuna wuu iska gudhi
doonaa, oo waa laga wada dhici doonaa khasnadda alaabta
qaaliga ahu ugu jirto. **16** Reer Samaariya gardarradooda way
qaadi doonaan, waayo, way ku caasiyowdeen Ilaahoodii.
Seef baa lagu layn doonaa, dhallaankoodana dhulkaa lagu
tuuri doonaa, oo naagahooda uurka lehna waa la dooxi
doonaa.

**14** Dadka Israa'iilow, u soo noqda Rabbiga Ilaahiinna
ah, waayo, xumaantiinnii waad ku dhacdeen. **2** Erayo
ula taga Rabbiga, oo waxaad ku tidhaahdaan, Xumaanta
oo dhan naga fogee oo si wanaagsan noo aqbal, oo
annaguna waxaan sidii dibi qurbaan ah kuu siin doonnaa
caabudidda bushimahayaga. **3** Reer Ashuur na badbaadin
maayo, oo annagu fardo fuuli mayno, oo weliba sancada
gacmahayagana mar dambe ku odhan mayno, Waxaad tihiin
ilaahayo. Waayo, agoontu adigay naxariis kaa helaan. **4**
Dibunoqoshadooda waan bogsiin doonaa, oo waxaan iyaga
u jeclaan doonaa si ikhtiyaar ah, waayo, cadhadaydii way
ka noqotay. **5** Waxaan dadka Israa'iil u noqon doonaa sida
sayaxa oo kale, oo iyaguna waxay u ubxin doonaan sida
ubaxa oo kale, oo waxay xididdada u mudan doonaan sida
Lubnaan oo kale. **6** Laamahoodu way kala bixi doonaan oo
quruxdooduna waxay ahaan doontaa sidii geedka saytuunka,
oo caraftooduna waxay ahaan doontaa sidii Lubnaan oo
kale. **7** Oo kuwa hadhka hoos joogaana way soo noqon
doonaan. Waxay u soo noolaan doonaan sida hadhuudhka
oo kale, oo waxay u ubxin doonaan sida canabka oo
kale. Udgoonkooduna wuxuu ahaan doonaa sida khamriga
Lubnaan oo kale. **8** Reer Efrayim waxay odhan doonaan,
Bal maxaa mar dambe annaga iyo sanamyo noo dhexeeya?
Anna waan u jawaabay oo waan fiirin doonaa. Waxaan ahay
sida geed beroosh ah oo qoyan, midhihiinna xaggaygaa laga
helaa. **9** Kii xigmad lahu waxyaalahan ha fiirsado. Kii miyir
lahuna ha garto. Waayo, Rabbiga jidadkiisu waa qumman
yihiin, oo kuwii xaq ahuna way ku socon doonaan, laakiinse
kuwa xadgudbaa way ku dhex dhici doonaan.

# Yoo'Eel

1 Kanu waa Eraygii Rabbiga oo u yimid Yoo'eel ina
Fetuu'eel. 2 Odayaashow, kan maqla, oo dadka dalka
degganow, dhammaantiin dhegta u dhiga. War tanu ma
waxay dhacday wakhtigiinnii mase wakhtigii awowayaashiin?
3 Haddaba idinku carruurtiinna u sheega, oo carruurtiinnuna
carruurtooda ha u sii sheegeen, oo carruurtooduna qarni
kale ha u sii sheegeen. 4 Wixii koronkorrada ka hadhay
ayax baa cunay, oo wixii ayaxa ka hadhayna laddaa baa
cunay, oo wixii laddaaga ka hadhayna diir baa cuntay. 5
Kuwiinna sakhraamiinta ahow, toosa, oo ooya, kuwiinna
khamriga cabta oo dhammow, khamrigii macaanaa aawadiis
u baroorta, waayo, waa idinka go'ay. 6 Waayo, dalkaygii
waxaa ku soo kacay quruun xoog badan oo aan tiro lahayn,
oo ilkahoodu waa sida ilko libaax oo kale, oo waxay leeyihiin
miciyo gool libaax oo kale. 7 Geedahaygii canabka ahaa way
baabbi'iyeen, oo dhirtaydii berdaha ahaydna way diirteen,
wayna mudhxiyeen oo kala tuurtuureen, oo laamahoodiina
waa qayax cad. 8 Haddaba u musannaaba sidii gabadh
joonyad xidhatay oo u barooranaysa arooskeedii ka dhintay.
9 Qurbaankii hadhuudhka iyo qurbaankii cabniinku waa
ka go'een gurigii Rabbiga, oo wadaaddada ah Rabbiga
midiidinnadiisa way barooranayaan. 10 Beertii way ba'day
oo dhulkii wuu barooranayaa, waayo, hadhuudhkii wuu
baabba'ay, oo khamrigii cusbaana waa engegay, oo saliiddiina
way cidlaanaysaa. 11 Kuwiinna beerreyda ahow, isku
naxa, oo kuwiinna beeraha canabka ah ka shaqeeyow,
u ooya sarreenka iyo shiciirka aawadood, waayo, beerta
midhaheedii way baabbe'een. 12 Canabkii wuu engegay, oo
berdihiina wuu dhaday, oo geedkii rummaanka, iyo geedkii
timirta, iyo geedkii tufaaxa, iyo xataa dhirtii berrinka ku
tiil oo dhammu way wada engegeen, oo farxaddiina way
ka dhammaatay binu-aadmiga. 13 Kuwiinna wadaaddada
ahow, joonyado guntada oo ooya, oo kuwiinna meesha
allabariga ka adeegow, baroorta. Ilaahayga midiidinnadiisow,
kaalaya oo habeenka oo dhan joonyado ku jiifa, waayo,
qurbaankii hadhuudhka iyo qurbaankii cabniinkaba waa laga
joojiyey gurigii Ilaahiinna. 14 Haddaba soon naadiya, oo shir
ku dhawaaqa, oo soo wada ururiya odayaasha iyo dadka
dalka deggan oo dhan, oo waxaad isugu keentaan guriga
Rabbiga Ilaahiinna ah, oo markaas Rabbiga u qayshada. 15
Waxaa hoogtay maalintaas! Waayo, maalintii Rabbigu way
soo dhow dahay, oo waxay u imanaysaa sida halligaad ka
timid xagga Ilaaha Qaadirka ah. 16 War cuntadii sow kama
go'in indhahayaga hortooda, farxaddii iyo rayrayntiina sow
kama baabbi'in gurigii Ilaahayaga? 17 Abuurkii la beeray
wuxuu ku qalalay ciidda hoosteeda, oo maqsinnadiina way
baabbe'een, oo bakhaarradiina waa la dumiyey, maxaa
yeelay, hadhuudhkii baa qalalay. 18 Xayawaanku aad iyo
aad bay u cabaadaan, oo sofyada lo'da ahu waxay la
welwelsan yihiin daaqla'aan, oo xataa xeryaha idaha ahu waa
dhibaataysan yihiin. 19 Rabbiyow, adigaan kuu qayshanayaa,
waayo, dab baa laastay daaqii cidlada, oo dhirtii duurka ku
tiilna olol baa wada gubay. 20 Haddaba xayawaankii duurku
biyahay kaa doonayaan, waayo, durdurradii biyuhu way
engegeen, oo daaqii cidladana dab baa laastay.

2 Siyoon buun ka dhex afuufa, oo buurtayda quduuska ah
ka dhawaajiya, oo dadka dalka deggan oo dhammu ha
wada gariireen, waayo, maalintii Rabbigu way imanaysaa, oo
haatan way soo dhow dahay. 2 Oo maalintaasu waa maalin
mugdi iyo gudcur ah, oo waa maalin cadar ah oo gudcur
qaro weyn ahu jiro, oo waxay u imanaysaa sida kaaha
waaberiga buuraha ku dul faafa. Bal eega dad tiro badan oo
xoog weyn! Dadkaas wax la mid ah hore looma arag, oo
iyaga dabadoodna wax la mid ahu ma jiri doonaan xataa tan
iyo sannado iyo qarniyo badan. 3 Hortooda dab baa wax
laasanaya, oo dabadoodana olol baa wax gubaya. Dhulka
iyaga ka horreeya waa sida Beer Ceeden, oo kan iyaga ka
dambeeyana waa sidii cidla baabba' ah oo kale, oo wax iyaga
ka baxsadayna innaba ma jiraan. 4 Muuqashoodu waa sida
muuq fardood oo kale, oo waxay u ordaan sida rag fardooley
ah. 5 Oo sanqadhkoodu waa sida gaadhifardood buuraha
dhaladooda boodboodaya, iyo sida olol dab oo bal gubaya,
iyo sida dad xoog badan oo dagaal u diyaargaroobay. 6
Hortooda dadyowgu way wada gariirayaan, oo qof kastaba
wejigiisa cabsi baa ka muuqanaysa. 7 Iyagu waxay hore ugu
ordayaan sida rag xoog badan, oo waxay derbiga u fuulayaan
sida rag dagaalyahan ah, oo midkood waluba halkiisuu
marayaa, oo kala leexan maayaan. 8 Oo midkoodna midka
kale riixi maayo, oo midkood waluba wuxuu ku socdaa
meeshiisa. Waxay ka dhex dusayaan hubka dagaalka
oo innaba socodkooda kama joogsadaan. 9 Magaalada
korkeeda ayay ku boodayaan, oo derbiga korkiisa ayay
ku ordayaan, oo guryahay soo korayaan, oo sida tuug oo
kale ayay daaqadaha ka soo galayaan. 10 Oo hortooda
dhulku wuu gariirayaa, samooyinkuna way ruxmanayaan, oo
qorraxdii iyo dayaxiina way madoobaadeen, oo xiddigihiina
iftiinkoodii way ceshadeen. 11 Rabbiga ayaa codkiisa kaga
hor hadlaya ciidankiisa, waayo, xeradiisu aad bay u weyn
tahay, oo midka eraygiisa oofinayaa waa xoog badan yahay,
waayo, Rabbiga maalintiisu waa weyn tahay, waana mid
cabsi badan aad iyo aad, haddaba bal yaa u adkaysan kara?

12 Haddaba haatan waxaa Rabbigu leeyahay, Qalbigiinna
oo dhan iigu soo jeesta, idinkoo sooman, oo ooyaya, oo
barooranaya. 13 Haddaba qalbigiinna jeexa ee dharkiinna
ha jeexina, oo Rabbiga Ilaahiinna ah xaggiisa u soo jeesta,
waayo, isagu waa nimco miidhan, waana raxmad badan
yahay, cadho wuu u gaabiya, waana naxariis badan yahay,
oo belaayadana wuu ka soo noqdaa. 14 Bal yaa garanaya
inuu isagu soo jeesan doono oo soo noqon doono, iyo
in kale, iyo inuu gadaashiisa kaga tegi doono barako,
taasoo qurbaan hadhuudh ah iyo qurbaan cabniin ah oo
aad Rabbiga Ilaahiinna ah u bixinaysaan? 15 Siyoon buun
ka dhex afuufa, oo soon naadiya, oo shir ku dhawaaqa.
16 Dadka soo ururiya, oo ururka quduus ka dhiga, oo
odayaasha soo shiriya, oo carruurta soo ururiya, iyo xataa
kuwa naasaha nuugaya. Aroosku qolkiisa ha ka soo baxo, oo
aroosadduna ilxidhkeeda ha ka soo baxdo. 17 Wadaaddada
midiidinnada Rabbiga ahu balbalada iyo meesha allabariga
dhexdooda ha ku ooyeen, oo iyagu ha yidhaahdeen,
Rabbiyow, dadkaaga u tudh, oo dadka dhaxalkaaga ah
wax la caayo ha ka dhigin oo yaanay quruumuhu iyaga
u taline. Waayo, bal maxaa dadyowga dhexdooda looga
odhan doonaa, Bal meeh Ilaahooda? 18 Markaasaa Rabbigu
u hinaasay dalkiisii, oo dadkiisuu u naxay. 19 Oo Rabbigu
waa u jawaabay dadkiisii oo wuxuu ku yidhi, Bal ogaada,
waxaan idiin soo dirayaa hadhuudh, iyo khamri, iyo saliid,
oo idinkuna waxaasaad ka dhergi doontaan, oo anna mar
dambe quruumaha dhexdooda wax la caayo idinkaga dhigi
maayo. 20 Laakiinse waan idinka fogayn doonaa ciidanka
woqooyi, oo isaga waxaan ku eryi doonaa dal abaar iyo
cidlo ah, oo qaybtiisa hore waxaan geeyn doonaa badda
bari, oo qaybtiisa dambena waxaan geeyn doonaa badda
galbeed, oo waxaa kor u soo bixi doona qudhunkiisa,
oo uurkiisa xumuna wuu soo kici doonaa, maxaa yeelay,
isagu wuxuu sameeyey waxyaalo waaweyn. 21 Haddaba
dal yahow, ha baqin, laakiinse farax, oo reyree, maxaa
yeelay, Rabbigu wuxuu sameeyey waxyaalo waaweyn. 22
Xayawaanka duurkow, ha cabsanina, waayo, naqii cidladu
waa soo baxayaa, oo dhirtiina midhaheeday dhalaysaa, oo
berdihii iyo canabkiiba way barwaaqoobayaan. 23 Haddaba
reer Siyoonay, farxa oo Rabbiga Ilaahiinna ah ku reyreeya,
waayo, roobkii hore buu si xaq ah idiin siiyey, oo wuxuu idiin
di'iyey roob, intii hore iyo intii dambeba sidii markii hore.
24 Oo goobaha wax lagu tumo waxaa ka buuxsami doona
sarreen, oo macsarooyinkuna waxay la buuxdhaafi doonaan
khamri iyo saliid. 25 Oo waxaan idiin soo celin doonaa waxa
ay sannadihii idinka cuneen ayaxa, iyo laddaaga, iyo diirta,
iyo koronkorradu, kuwaas oo ahaa ciidankii weynaa oo aan
idiin soo diray. 26 Oo idinku wax badan baad cuni doontaan
oo waad dhergi doontaan, oo waxaad ammaani doontaan
magaca Rabbiga Ilaahiinna ah oo waxa yaabka badan
idiin sameeyey, oo dadkayguna innaba ma ay ceeboobi
doonaan. 27 Oo markaas waxaad ogaan doontaan inaan
dadka Israa'iil dhex joogo, iyo inaan anigu ahay Rabbiga
Ilaahiinna ah, oo aan ilaah kale jirin, oo dadkayguna innaba
ma ay ceeboobi doonaan. 28 Oo markaas dabadeedna
anigu ruuxayga ayaan ku shubi doonaa dad oo dhan, oo
wiilashiinna iyo hablihiinnu wax bay sii sheegi doonaan,
oo odayaashiinnuna riyooyin bay ku riyoon doonaan, oo
raggiinna dhallinyarada ahuna wax bay arki doonaan, 29
oo weliba maalmahaas addoommada rag iyo dumarba
ruuxaygaan ku shubi doonaa. 30 Oo waxaan samooyinka iyo
dhulkaba ka muujin doonaa yaabab, kuwaasoo ah dhiig, iyo
dab, iyo tiirar qiiq ah. 31 Qorraxdu waxay u beddelmi doontaa
gudcur, dayaxuna wuxuu u beddelmi doonaa dhiig, intaanay
iman maalinta Rabbiga oo weyn oo cabsida badanu. 32
Oo waxay noqon doontaa in ku alla kii magaca Rabbiga
ku barya uu samatabbixi doono, waayo, Buur Siyoon iyo
Yeruusaalem, iyo kuwa hadhay oo Rabbigu u yeedhayba
waxaa jiri doona kuwo u baxsada sidii Rabbigu yidhi.

**3** Bal eeg, waayahaas iyo wakhtigaas, markaan soo celin
doono maxaabiistii dadka Yahuudah iyo reer Yeruusaalem,
2 ayaan quruumaha oo dhan soo wada ururin doonaa, oo
wada keeni doonaa dooxada Yehooshaafaad, oo halkaasaan
iyaga ugu xukumi doonaa dadkayga iyo dhaxalkayga oo
dadka Israa'iil ah aawadood, waayo, quruumaha way ku kala
dhex firdhiyeen, oo dhulkaygiina way qaybsadeen. 3 Oo
iyagu dadkaygii way u saami riteen, oo wiil bay dhillo kiro u
siiyeen, oo gabadhna waxay ku iibiyeen khamri ay cabbaan.
4 Haddaba Turos, iyo Siidoon, iyo kulli gobollada Falastiin oo
dhammow, bal maxaad iga doonaysaan? Ma abaalgud baad
ii siinaysaan? Oo haddaad ii abaalguddaan, intaan dhaqsado
ayaan degdeg abaalgudkiinna madaxiinna ugu soo celin
doonaa. 5 Waxaad qaadateen lacagtaydii iyo dahabkaygii,
oo alaabtaydii wanaagsanayd oo qurxoonaydna waxaad
geliseen macbudyadiinna, 6 oo weliba dadka Yahuudah iyo
reer Yeruusaalemna waxaad ka iibiseen dadka Gariigta ah,
si aad iyaga dalkooda uga fogaysaan aawadeed. 7 Haddaba
bal ogaada, iyagii waxaan ka soo kicin doonaa meeshii
aad ka iibiseen, oo abaalgudkiinnana waxaan ku soo celin
doonaa madaxiinna, 8 oo wiilashiinna iyo gabdhihiinnaba
waxaan ka iibin doonaa dadka Yahuudah, oo waxay ka sii
iibin doonaan dadka reer Shebaa oo ah quruun aad u fog,
waayo, Rabbiga ayaa saas ku hadlay. 9 Haddaba quruumaha

dhexdooda saas ka naadiya, Dagaal isu diyaariya, oo ragga
xoogga badan oo dhan soo kiciya. Ragga dagaalyahanka
ah oo dhammu ha soo dhowaadeen oo iyagu ha soo
baxeen. **10** Haddaba birtii marashiyadiinna seefo ka tunta,
oo manjooyinkiinnana warmo ka tunta, oo kii itaal yaru
ha yidhaahdo, Xoog baan leeyahay. **11** Quruumaha nagu
wareegsan oo dhammow, kaalaya oo soo dhaqsada, oo
dhammaantiin isa soo wada urursada. Rabbiyow, kuwaaga
xoogga badan halkan u soo dir. **12** Haddaba quruumuhu ha
kaceen, oo ha yimaadeen dooxada Yehooshaafaad, waayo,
halkaasaan u fadhiisan doonaa inaan xukumo quruumaha
hareeraha ku wareegsan oo dhan. **13** Waxa beerta laga
goosan lahaa way bislaadeene haddaba mindi la gala,
oo macsaradii canabku way buuxdaaye kaalaya ku tunta,
berkedihii macsarooyinka way buuxdhaafeen, waayo, iyaga
xumaantoodu way weyn tahay. **14** Dad badan oo badan ayaa
ku jira dooxada xukunka la gooyay, waayo, maalintii Rabbigu
way ku soo dhow dahay dooxada xukunka. **15** Qorraxdii iyo
dayaxii way madoobaadeen, oo xiddigihiina iftiinkoodii way
ceshadeen. **16** Rabbigu Buur Siyoon buu ka qaylin doonaa,
oo codkiisuu kaga hadli doonaa Yeruusaalem, oo kolkaasay
samooyinka iyo dhulkuba gariiri doonaan, laakiinse Rabbigu
wuxuu dadkiisa u ahaan doonaa magangal, oo reer binu
Israa'iilna wuxuu u ahaan doonaa qalcad adag. **17** Oo
sidaasaad ku ogaan doontaan inaan anigu ahay Rabbiga
Ilaahiinna ah, oo aan deggan ahay Siyoon oo ah buurtayda
quduuska ah, oo markaasay Yeruusaalem quduus noqon
doontaa, oo shisheeyayaal dambena iyada ma dhex mari
doonaan innaba. **18** Oo wakhtigaas buuraha waxaa ka
soo tifqi doona khamri macaan, oo kurahana caanaa ka
soo shubmi doona, oo webiyaasha dalka Yahuudah oo
dhammuna way durduri doonaan, oo guriga Rabbigana
waxaa ka bixi doonta il biyo ah, wayna waraabin doontaa
dooxada Shitiim. **19** Dulmigii dadka Yahuudah lagu sameeyey
aawadeed ayaa dalka Masar cidlo noqon doonaa, oo dalka
reer Edomna wuxuu ahaan doonaa lamadegaan abaar ah,
maxaa yeelay, iyagu dhiig aan xaq qabin ayay dalkooda ku
dhex daadiyeen. **20** Laakiinse dadka Yahuudah weligiis wuu
jiri doonaa, oo Yeruusaalemna way raagi doontaa ab ka ab.
**21** Oo waxaan u aari doonaa dhiiggoodii aanan hore ugu
aarin, waayo, Rabbigu Buur Siyoon buu deggan yahay.

# Caamoos

**1** Kuwanu waa erayadii Caamoos oo ka mid ahaa xoolojirkii
reer Teqooca, iyo wixii uu arkay oo ku saabsanaa dalka
Israa'iil wakhtigii uu Cusiyaah dalka Yahuudah boqorka
ka ahaa, iyo wakhtigii uu Yaaraabcaam ina Yoo'aash
dalka Israa'iil boqorka ka ahaa, muddo laba sannadood ka
horraysay dhulgariirkii. **2** Oo isagu wuxuu yidhi, Rabbigu Buur
Siyoon buu ka qaylin doonaa, oo codkiisuu Yeruusaalem
kaga hadli doonaa, kolkaasay daaqsiimaha adhijirradu
barooran doonaan, oo Buur Karmel dhaladeeduna way
engegi doontaa. **3** Rabbigu wuxuu leeyahay, Saddex iyo
weliba afar xadgudub oo ay reer Dimishaq sameeyeen
aawadood ayaanan ciqaabtooda uga noqonaynin, maxaa
yeelay, iyagu waxay reer Gilecaad kula tunteen alaab bir
ah oo hadhuudh lagula tunto. **4** Laakiinse dab baan u
soo diri doonaa guriga Xasaa'eel, oo wuxuu wada laasan
doonaa daaraha waaweyn oo Benhadad. **5** Rabbigu wuxuu
leeyahay, Qataarkii albaabka Dimishaq waan jebin doonaa,
oo waxaan dooxada Aawen ka wada baabbi'in doonaa
dadka deggan, oo weliba kan haysta usha boqornimada
ayaan reer Ceeden ka gooyn doonaa, oo dadka Suuriyana
maxaabiis ahaan baa loogu kaxaysan doona Qiir. **6** Rabbigu
wuxuu leeyahay, Saddex iyo weliba afar xadgudub oo ay
reer Gaasa sameeyeen aawadood ayaanan ciqaabtooda
uga noqonaynin, maxaa yeelay, iyagu dadkii oo dhan ayay
maxaabiis ahaan u kaxaysteen si ay ugu gacangeliyaan reer
Edom. **7** Laakiinse dab baan ku soo dayn doonaa derbiga
Gaasa, oo wuxuu laasan doonaa daaraheeda waaweyn. **8**
Sayidka Rabbiga ahu wuxuu leeyahay, Waxaan Ashdood ka
wada baabbi'in doonaa dadka deggan, oo weliba kan haysta
usha boqornimada ayaan reer Ashqeloon ka gooyn doonaa,
oo waxaan gacantayda ku soo jeedin doonaa reer Ceqroon,
oo kuwa reer Falastiin ka hadhayna way wada baabbi'i
doonaan. **9** Rabbigu wuxuu leeyahay, Saddex iyo weliba
afar xadgudub oo ay reer Turos sameeyeen aawadood
ayaanan ciqaabtooda uga noqonaynin, maxaa yeelay, iyagu
dadkii oo dhan ayay u gacangeliyeen reer Edom, oo soo
mana ay xusuusan axdigii walaalnimada. **10** Laakiinse
dab baan ku soo dayn doonaa derbiga Turos, oo wuxuu
wada laasan doonaa daaraheeda waaweyn. **11** Rabbigu
wuxuu leeyahay, Saddex iyo weliba afar xadgudub oo ay
reer Edom sameeyeen aawadood ayaanan ciqaabtooda
uga noqonaynin, maxaa yeelay, iyagu walaalahood bay
seef ku eryadeen, oo way iska xooreen naxariis oo dhan,
oo xanaaqoodiina had iyo goorba bay la qarxeen, oo
cadho bay la gubanayeen weligoodba. **12** Laakiinse dab
baan ku soo dayn doonaa Teemaan, oo wuxuu wada
laasan doonaa daaraha waaweyn oo Bosraah. **13** Rabbigu
wuxuu leeyahay, Saddex amase afar xadgudub oo ay reer
Cammoon sameeyeen aawadood ayaanan ciqaabtooda
uga noqonaynin, maxaa yeelay, iyagu waxay dooxeen
naagihii uurka lahaa oo reer Gilecaad si ay xudduudkooda
u ballaadhsadaan aawadeed. **14** Laakiinse dab baan ku
soo dayn doonaa derbiga Rabbaah, oo wuxuu wada laasan
doonaa daaraheeda waaweyn, oo maalinta dagaalka waa
la qaylin doonaa, oo maalinta dabaysha cirwareentana
duufaan baa ku dhici doona. **15** Rabbigu wuxuu leeyahay,
Boqorkooda maxaabiis ahaan baa loo kaxaysan doonaa
isaga iyo amiirradiisaba.

**2** Rabbigu wuxuu leeyahay, Saddex iyo weliba afar
xadgudub oo ay reer Moo'aab sameeyeen aawadood
ayaanan ciqaabtooda uga noqonaynin, maxaa yeelay, iyagu
waxay gubeen lafihii boqorka reer Edom ilaa ay nuurad
noqdeen. **2** Laakiinse dab baan ku soo dayn doonaa dalka
Moo'aab, oo wuxuu wada laasan doonaa daaraha waaweyn
oo Qiryood, oo reer Moo'aab waxay ku dhiman doonaan
buuq iyo qaylo iyo buun dhawaaqiis. **3** Oo Rabbigu wuxuu
leeyahay, Anigu xaakinka waan ka baabbi'in doonaa dalka
Moo'aab dhexdiisa, oo amiirradiisa oo dhanna waan la layn
doonaa. **4** Rabbigu wuxuu leeyahay, Saddex iyo weliba afar
xadgudub oo ay dadka Yahuudah sameeyeen aawadood
ayaanan ciqaabtooda uga noqonaynin, maxaa yeelay, iyagu
sharcigii Rabbiga way diideen, oo qaynuunnadiisiina ma
ay xajin, oo beentoodii baa iyaga qaladday, taasoo ay
awowayaashoodba daba socon jireen. **5** Laakiinse dab baan
ku soo dayn doonaa dalka Yahuudah, oo wuxuu wada laasan
doonaa daaraha waaweyn oo Yeruusaalem. **6** Rabbigu
wuxuu leeyahay, Saddex iyo weliba afar xadgudub oo ay
dadka Israa'iil sameeyeen aawadood ayaanan ciqaabtooda
uga noqonaynin, maxaa yeelay, kii xaqa ahaa lacag bay ku
iibiyeen, oo kii baahnaana waxay ku iibiyeen laba kabood. **7**
Aad bay u damacsan yihiin inay arkaan boodhka dhulka ee
kor saaran madaxa masaakiinta, wayna qalloociyaan jidka
kuwa camalka qabow. Oo nin iyo aabbihiisba waxay u wada
galaan isku gabadh, oo sidaasay magacayga quduuska ah ku
nijaaseeyaan. **8** Oo meel kasta oo allabariba agteed waxay
ku jiifsadaan dhar rahmad loo qaatay, oo guriga Ilaahoodna
waxay ku dhex cabbaan khamrigii kuwa la ganaaxay. **9**
Laakiin anigu hortoodaan ka baabbi'iyey kii reer Amor oo
sarajooggiisu ahaa sida sarajoogga geedaha kedarka la
yidhaahdo, oo u xoogga badnaa sida geedaha alloonka
la yidhaahdo, oo weliba midhihiisii waan ka baabbi'iyey

xagga sare, oo xididdadiisiina waan ka baabbi'iyey xagga
hoose. 10 Oo weliba dalkii Masar waan idinka soo bixiyey,
oo afartan sannadood ayaan cidladii idinku hor kacayay, si
aad u hantidaan dalkii reer Amor. 11 Oo wiilashiinnii waxaan
ka kiciyey nebiyo, oo barbaarradiinniina waxaan ka kiciyey
kuwa Nadiirrada ah ee Ilaah loo soocay. Dadka Israa'iilow,
sow saas ma aha? ayaa Rabbigu leeyahay. 12 Laakiinse
idinku Nadiirradii waxaad siiseen khamri ay cabbaan, oo
nebiyadiina intaad amarteen ayaad ku tidhaahdeen, Innaba
waxba ha sii sheegina. 13 Bal eega, hoostiina baan ugu
hoos riixmay sida gaadhiga xidhmooyin bal ah ka buuxan u
riixmo. 14 Kan dheereeyaa ma carari kari doono, oo kan
xoogga badanuna xooggiisa kuma adkaan doono, oo kan
itaalka badanuna isma samatabbixin doono, 15 oo kan
qaansada haystaana isma taagi doono, oo kan cagaha ka
dheereeyaana isma samatabbixin doono, oo kii faras ku
joogaana isma samatabbixin doono, 16 oo kuwa xoogga leh
kii ugu geesinimo badanuna maalintaas wuu carari doonaa
isagoo qaawan, ayaa Rabbigu leeyahay.

3 Reer binu Israa'iilow, bal maqla eraygan Rabbigu idinkaga
hadlay. Waxaan kaga hadlay dadkii aan dalka Masar ka
soo bixiyey oo dhan, anigoo leh, 2 Idinka oo keliya ayaan
idinka iqiin qolooyinka dhulka deggan oo dhan, haddaba
xumaatooyinkiinnii oo dhan ayaan idiin ciqaabi doonaa. 3
Laba qof miyey wada socdaan haddaanay heshiis ahayn? 4
Aar miyuu duudda ka ciyaa, hadduusan raq haysan? Aaran
libaax miyuu bohoshiisa ka qayliyaa, hadduusan waxba soo
qaadan? 5 Shimbiru miyey dabin dhulka ku kor yaal ku
dhici kartaa, haddaan siriq loo dhigin? Dabin miyuu dhulka
ka boodda isagoo aan innaba wax qabsan? 6 Haddiise
magaalo buun laga dhex afuufo, miyaan dadku cabsan?
Miyaa belaayo magaalo ku dhacdaa, haddaan Rabbigu
saas ku samayn? 7 Sida xaqiiqada ah Sayidka Rabbiga
ahu waxba ma samayn doono, inuu qarsoodiga u muujiyo
addoommadiisa nebiyada ah mooyaane. 8 Aarkii waa ciyey,
haddaba bal yaan cabsanayn? Sayidka Rabbiga ahu waa
hadlay, haddaba bal yaa wax sii sheegi waayaya? 9 Warkan
ka dhex naadiya daaraha waaweyn ee Ashdood ku yaal
iyo daaraha waaweyn ee dalka Masar ku dhex yaalba, oo
waxaad tidhaahdaan, War waxaad ku soo shirtaan buuraha
Samaariya korkooda, oo bal eega buuqa weyn oo halkaas
ku jira, iyo dulmiga ku dhex jira. 10 Waayo, Rabbigu wuxuu
leeyahay, Kuwa daarahooda waaweyn ku soo urursadaa
wixii xoog iyo tuugnimo lagu soo dhacay ma ay gartaan si ay
wax qumman u sameeyaan. 11 Haddaba Sayidka Rabbiga
ahu wuxuu leeyahay, Cadow baa dalka hareerayn doona, oo
isna xooggiinna wuu idinka qaadi doonaa, oo daarihiinna
waaweynna waa la wada dhici doonaa. 12 Rabbigu wuxuu
leeyahay, Sida adhijirku afka libaaxa uga badbaadiyo laba
lugood, amase dheg go'eed, saasoo kalaa loo badbaadin
doonaa dadka Israa'iil ee Samaariya deggan oo ku fadhiya
sariirta rukunkeeda iyo gogosha barkimaheeda xariirta ah.
13 Sayidka Rabbiga ah oo ah Ilaaha ciidammadu wuxuu
leeyahay, Maqla oo ku markhaati fura reerka Yacquub. 14
Maalinta aan dadka Israa'iil xadgudubyadooda u ciqaabi
doono ayaan weliba meelaha allabariga ee Beytel baabbi'in
doonaa, oo meelaha allabariga geesahooda ka taagan waa
la wada jari doonaa, oo dhulkay ku soo dhici doonaan. 15
Oo Rabbigu wuxuu leeyahay, Waan dumin doonaa guryaha
gabowga iyo guryaha kulaylkaba, oo guryaha foolmaroodiga
ahuna way wada baabbi'i doonaan, oo daaraha waaweynuna
way wada dhammaan doonaan.

4 Eraygan maqla, kuwiinnan ah sacaha Baashaan oo buurta
Samaariya jooga, oo masaakiinta dulma, oo kuwa baahan
cadaadiya, oo sayidyadooda ku yidhaahda, Wax noo keena,
oo kaalaya aan cabnee. 2 Sayidka Rabbiga ahu wuxuu ku
dhaartay quduusnimadiisa, isagoo leh, Bal eega, waxaa iman
doona wakhti laydinkula tegi doona qabatooyin, oo jillaabbo
baa lagu qabsan doonaa kuwiinna hadhay. 3 Oo Rabbigu
wuxuu leeyahay, Midkiin kastaaba meelaha jajaban buu ka
soo dusi doonaa hortiisa, oo waxaad isku tuuri doontaan
Harmoon. 4 Beytel kaalaya, oo xadgudba, Gilgaal kaalaya,
oo xadgudubyo sii badiya, oo subax walba allabaryadiinna
keena, oo marba saddexdii maalmood waxaad keentaa
meeltobnaadyadiinna. 5 Oo allabari mahadnaqid ah ka
bixiya wixii la khamiiriyey, oo waxaad ku dhawaaqdaan oo
naadisaan qurbaanno ikhtiyaar loo keeno, waayo, saasaad
jeceshihiin, dadka Israa'iilow, ayaa Sayidka Rabbiga ahu
leeyahay. 6 Rabbigu wuxuu leeyahay, Magaalooyinkiinna
oo dhan waxaan idinku siiyey ilko nadiifsan oo ka timaado
cuntola'aan ka dhacda meelihiinna oo dhan, laakiinse iima
aydaan soo noqon. 7 Oo anna roobkii waan idinka ceshaday
markii ay saddex bilood ka hadhay xilligii beergoosashada,
oo magaalo baan roob ku di'iyey, magaalo kalena roob kuma
aan di'in. Roob baa meel ku da'ay, oo meeshii aan roobku
ku di'inna way engegtay. 8 Sidaas daraaddeed laba ama
saddex magaalo ayaa magaalo u soo wareegay inay biyo
ka cabbaan aawadeed, oo kamana ay wabxin, laakiinse
iima aydaan soo noqon ayaa Rabbigu leeyahay. 9 Waxaan
idinku dhuftay beera-engeeg iyo caariyaysi, oo beerihiinnii
badnaa, iyo beercanabyadiinnii, iyo dhirtiinnii berdaha ahayd,
iyo dhirtiinnii saytuunka ahaydba waxaa wada laasatay

koronkorrada, laakiinse iima aydaan soo noqon ayaa Rabbigu
leeyahay. 10 Waxaan idinku soo dhex daayay cudur belaayo
sidaan Masar ugu soo daayay oo kale. Barbaarradiinnii seef
waan ku laayay, oo fardihiinniina waan wada kaxaystay,
oo waxaan ka dhigay in qudhunkii xeradiinnu uu xataa
soo gaadho sankiinna dulalkiisa, laakiinse iima aydaan
soo noqon ayaa Rabbigu leeyahay. 11 Oo qaarkiin waan
u afgembiyey sidii markii Ilaah u afgembiyey Sodom iyo
Gomora, oo idinna waxaad ahaydeen sidii qori ololaya oo
dab laga soo dhiftay, laakiinse iima aydaan soo noqon ayaa
Rabbigu leeyahay. 12 Haddaba dadka Israa'iilow, sidaasaan
idinku samayn doonaa, oo waxan aan idinku samayn doona
aawadeed isu diyaariya inaad Ilaahiinna la kulantaan, dadka
Israa'iilow. 13 Waayo, bal eega, kan buuraha sameeya, oo
dabaysha uuma, oo binu-aadmiga u sheega waxa fikirkiisu
yahay, kan subaxdii gudcur ka dhiga, oo ku kor tunta dhulka
meelihiisa sare, magiciisu waxaa weeye Rabbiga oo ah
Ilaaha ciidammada.

**5** Dadka Israa'iilow, maqla eraygan aan idiinku barooranayo.
2 Bikradda ah dalka Israa'iil waa dhacday, oo mar dambena
ma sara joogsan doonto. Dalkeedii ayaa lagu dayriyey, oo
qof kor u qaada lama arko. 3 Waayo, Sayidka Rabbiga ahu
wuxuu leeyahay, Magaaladii ay kuni ka bixi jireen boqol baa u
hadhi doona, oo tii ay boqoli ka bixi jireenna toban baa dadka
Israa'iil u hadhi doona. 4 Waayo, Rabbigu wuxuu dadka
Israa'iil ku leeyahay, Aniga i doondoona aad noolaataane. 5
Laakiinse Beytel ha doondoonina, Gilgaalna ha gelina, Bi'ir
Shebacna ha u gudbina, waayo, sida xaqiiqada ah Gilgaal
maxaabiisnimo bay geli doontaa, oo Beytelna way baabbi'i
doontaa. 6 Si aad u noolaataan, oo uusan Rabbigu sidii dab
reer Yuusuf ugu soo farabbaxsan, oo aan dabku laasan, oo
aan Beytel laga waayin wax demiya, Rabbiga doondoona, 7
kuwiinna caddaaladda u roga dacar oo xaqnimadana dhulka
ku tuura. 8 Doondoona kan sameeyey ururrada xiddigaha
ah oo la yidhaahdo Toddobaadyada iyo Oriyon, oo gudcurka
subaxnimo u beddela, oo maalintana madoobeeya si ay
habeen u noqoto, kan biyaha badda u yeedha oo dhulka
ku daadiya, magiciisu waa Rabbi. 9 Isagu baabba' buu ku
dejiyaa kuwa xoogga badan, si ay baabba'du ugu dhacdo
qalcadda. 10 Way neceb yihiin kii iridda wax ku canaanta, oo
way karhaan kii si qumman u hadla. 11 Miskiinka baad ku
tumataan, oo waxaad ka qaadataan sarreen badan, sidaas
daraaddeed guryihii aad dhagax la qoray ka dhisateen
kuma hoyan doontaan, oo beercanabyadii wanwanaagsanaa
ee aad beerateenna khamrigooda kama cabbi doontaan.
12 Waayo, waan ogahay xadgudubyadiinnu inay badan
yihiin, iyo dembiyadiinnu inay waaweyn yihiin, kuwiinnan
kii xaqa ah dhiba, ee laaluush qaata, oo masaakiinta
iridda joogtana xaqooda ka leexiya. 13 Haddaba kii miyir
lahu wakhtigaas wuu aamusnaan doonaa, waayo, waa
wakhti shar ah. 14 Wanaagga doondoona, sharkase ha
doondoonina, aad noolaataane, oo sidaasuu Rabbiga ah
Ilaaha ciidammadu idiinla jiri doonaa sidaad u tidhaahdaan.
15 Sharka nebcaada, oo wanaagga jeclaada, oo caddaalad
iridda ku sameeya, waayo, waxaa suurtowda in Rabbiga
ah Ilaaha ciidammadu uu u roonaado kuwa reer Yuusuf ka
hadhay. 16 Haddaba Rabbiga ah Ilaaha ciidammada oo
ah Sayidku wuxuu leeyahay, Dariiqyada oo dhan waxaa
ka yeedhi doonta baroor, oo jidadka oo dhan waxaa laga
odhan doonaa, Hoogay! Hoogay! Oo ninka beerreyda ah
waxaa loogu yeedhi doonaa tacsi, oo kuwa baroorta aad u
yaqaanna waxaa loogu yeedhi doonaa baroorasho. 17 Oo
beercanabyada oo dhanna waxaa jiri doonta baroorasho,
waayo, Rabbigu wuxuu leeyahay, Anigu waan idin dhex
mari doonaa. 18 Kuwiinna maalinta Rabbiga jeclaystow, waa
idiin hoog. Maxaad maalinta Rabbiga u doonaysaan? Waa
gudcur, oo iftiin ma aha. 19 Waa sidii nin libaax ka cararay oo
orso ka hor timid, ama intuu guri galay derbiga ku tiirsaday
oo markaas abeeso gacanta ka qaniintay. 20 Maalinta
Rabbigu sow ma ahaan doonto gudcur aan iftiin lahayn,
iyo xataa gudcur weyn oo aan dhalaal lahayn? 21 Iidihiinna
waan nebcahay, waanna quudhsadaa, oo shirarkiinnana
kuma farxo. 22 In kastoo aad ii bixisaan qurbaannadiinna
aad gubtaan iyo qurbaannadiinna hadhuudhka ah anigu
aqbali maayo, oo qurbaannadiinna nabaadiino oo xoolihiinna
buurbuuranna dan ka yeelan maayo. 23 Iga fogeeya qaylada
gabayadiinna, waayo, anigu dhegaysan maayo luuqda
shareeradihiinna. 24 Laakiinse caddaaladdu sida biyo ha u
qulqusho, oo xaqnimaduna sida webi fatahaya ha u yaacdo.
25 Bal reer binu Israa'iilow, allabaryo iyo qurbaanno miyaad
cidladii iigu bixiseen afartankii sannadood? 26 Waxaadse
sidateen Taambuuggii Moleg iyo sanamyadii Kiyuun, kaasoo
ah xiddigtii ilaahiinnii ee aad nafsaddiinna u samaysateen. 27
Haddaba sidaas daraaddeed Rabbiga magiciisu yahay Ilaaha
ciidammadu wuxuu leeyahay, Anigu waxaan idinka dhigi
doonaa in maxaabiis ahaan laydiinku kaxaysto Dimishaq
shishadeeda.

**6** Waxaa iska hoogay kuwa Siyoon xasilloonaan ku nool,
oo buurta Samaariya ammaan ku deggan, kuwaasoo ah
kuwa caanka ah ee madaxda quruumaha oo dadka Israa'iil
u yimaadaan! 2 Kalneh u gudba oo bal eega, oo halkaasna
ka sii taga Xamaad tan weyn, dabadeedna waxaad sii

tagtaan Gad ta reer Falastiin. Iyagu miyey ka wanaagsan
yihiin boqortooyooyinkaas? Dalkoodu miyuu ka weyn yahay
dalkiinna? 3 Waxaa iska hoogay kuwiinna maalintii sharka
fogeeya, oo ka dhiga fadhigii dulmiga inuu soo dhowaado,
4 oo sariiro foolmaroodi ah ku jiifsada, oo gogosha isku
kala bixiya, oo cuna baraarka idaha iyo weylaha edegga
ku dhex jira, 5 oo u heesa dhawaaqa shareeradda, oo isu
hindisa alaab muusiko sidii kuwii Daa'uud, 6 oo khamriga
maddiibadaha ku cabba, oo ku subkada saliidda ugu wada
fiican, laakiinse kama murugaysna dhibaatada reer Yuusuf
haysata. 7 Haddaba sidaas daraaddeed iyagu waxay haatan
raaci doonaan kuwa marka hore maxaabiis ahaanta loo
kaxaysan doono, oo diyaafadda kuwa iskala bixin jiray waa
dhammaan doontaa. 8 Rabbiga ah Ilaaha ciidammadu
wuxuu leeyahay, Sayidka Rabbiga ahu wuxuu ku dhaartay
nafsaddiisa, oo yidhi, Anigu waan karhay islaweynaanta reer
Yacquub, oo waan nebcahay daarihiisa waaweyn, sidaas
daraaddeed magaalada iyo waxa ku dhex jira oo dhanba
cadow baan u gacangelin doonaa. 9 Oo haddii toban nin
guri keliya ku hadho way dhiman doonaan. 10 Oo markii nin
adeerkiis oo ah kan isaga gubi doona uu kor u qaado inuu
lafaha guriga ka soo bixiyo, oo uu ku yidhaahdo kan guriga
gudihiisa shishe ku jira, War weli ma qaar baa kula jooga?
Oo isna uu yidhaahdo, Maya, markaasuu ku odhan doonaa,
War naga aamus, waayo, waa inaannan magaca Rabbiga
soo qaadin. 11 Waayo, bal eeg, Rabbigu waa amraa, oo
daarta weyn waxaa lagu dhufan doonaa daldalool, guriga
yarna waxaa lagu dhufan dildillaac. 12 Miyaa fardo dhagaxa
ku ordi doonaan? Miyaase mid halkaas dibi ku beerjeexi
doonaa? Laakiin, idinku garsooriddii waxaad u beddesheen
xammeeti, oo midhihii xaqnimadana waxaad u beddesheen
dacar. 13 Waxaad ku rayraysaan wax aan waxtar lahayn, oo
waxaad tidhaahdaan, Miyaannan geeso kula soo yeelan
xooggayaga? 14 Laakiinse bal eega, dadka dalka Israa'iilow,
Rabbiga ah Ilaaha ciidammadu wuxuu leeyahay, Quruun
baan idinku soo kicin doonaa, oo iyana waxay idinku dhibi
doonaan tan iyo meesha Xamaad laga galo iyo ilaa webiga
Carabaah.

**7** Sayidka Rabbiga ahu wax buu i tusay, oo bal eeg, wuxuu
sameeyey ayax markii fufkii dambe bilowday, oo bal
eeg, waxay ahayd fufkii dambe markii boqorka cawskiisa la
gooyay dabadeed. 2 Oo markay dhammeeyeen cunitaankii
cawskii dalka ayaan idhi, Sayidow, Rabbiyow, waan ku
baryayaaye, na cafi, waayo, bal reer Yacquub sidee bay isu
taagi doonaan? Waayo, iyagu waa yar yihiin. 3 Markaasaa
Rabbigu taas ka soo noqday, oo Rabbigu wuxuu yidhi, Taasu
ahaan mayso. 4 Sayidka Rabbiga ahu wax buu i tusay, oo bal
eeg, Sayidka Rabbiga ahu wuxuu amray in dab lagu diriro,
oo dabku wuxuu laastay moolkii weynaa, oo wuxuu cuni
lahaa dhulka. 5 Markaasaan idhi, Sayidow, Rabbiyow, waan
ku baryayaaye jooji, waayo, bal reer Yacquub sidee bay isu
taagi doonaan? Waayo, iyagu waa yar yihiin. 6 Markaasaa
Rabbigu taas ka soo noqday, oo Sayidka Rabbiga ahu
wuxuu yidhi, Taasuna ahaan mayso. 7 Oo haddana wax
buu i tusay, oo bal eeg, Sayidku wuxuu ag istaagay derbi
xadhig miisaan leh lagu sameeyey, isagoo xadhig miisaan
leh gacanta ku haysta. 8 Markaasaa Sayidku wuxuu igu
yidhi, Caamoosow, maxaad aragtaa? Oo anna waxaan
ku idhi, Waxaan arkaa xadhig miisaan leh. Markaasaa
Sayidku wuxuu yidhi, Bal eeg, anigu xadhig miisaan leh
baan dhigi doonaa dadkayga Israa'iil dhexdooda, oo mar
dambena iyaga iska dhaafi maayo. 9 Oo meelaha sare
ee reer Isxaaq cidla way noqon doonaan, oo meelaha
quduuska ah ee dalka Israa'iilna way baabbi'i doonaan, oo
anna reerka Yaaraabcaam seef baan kula kici doonaa. 10
Markaasaa Amasyaah oo ahaa wadaadkii Beytel farriin u
diray Yaaraabcaam oo ahaa boqorkii dalka Israa'iil, oo wuxuu
ku yidhi, Caamoos shirqool buu kuugu dhigay dadka Israa'iil
dhexdooda, oo dadka dhulkuna erayadiisa oo dhan ma qaadi
karaan. 11 Waayo, Caamoos wuxuu leeyahay, Yaaraabcaam
seef buu ku dhimanayaa, oo dadka Israa'iilna sida xaqiiqada
ah maxaabiis ahaan waa looga kaxaysanayaa dalkooda. 12
Oo weliba Amasyaah wuxuu Caamoos ku yidhi, War wax
arke yahow, tag, oo dalka Yahuudah u carar, oo halkaas
wax ka cun, oo halkaas wax ku sii sheeg. 13 Laakiinse
mar dambe Beytel waxba ha ku sii sheegin, waayo, waa
boqorka meeshiisii quduuska ahayd oo waa daar boqoreed.
14 Markaasaa Caamoos jawaabay oo wuxuu Amasyaah
ku yidhi, Anigu nebi ma aan ahayn, nebi wiilkiisna ma
aan ahayn, laakiinse waxaan jiray adhijir iyo mid midhaha
darayga urursada, 15 oo Rabbigu waa ii soo yeedhay anigoo
adhi jiraya, markaasuu Rabbigu igu yidhi, Tag, oo dadkayga
Israa'iil wax u sii sheeg. 16 Haddaba bal maqal erayga
Rabbiga. Adigu waxaad leedahay, Wax dadka Israa'iil ka
gees ah ha sii sheegin, oo wax reer Isxaaq ka gees ahna ha
ku hadlin. 17 Haddaba Rabbigu wuxuu leeyahay, Naagtaadu
dhillo bay ku ahaan doontaa magaalada, oo wiilashaada iyo
gabdhahaaguba seef bay ku dhiman doonaan, oo dhulkaaga
xadhig baa lagu qaybsan doonaa, oo adna waxaad ku dhex
dhiman doontaa dal nijaasaysan, oo dadka Israa'iilna sida
xaqiiqada ah maxaabiis ahaan waa looga kaxaysan doonaa
dalkooda.

8 Oo haddana Sayidka Rabbiga ahu wax buu i tusay,
oo waxaan arkay dambiil midho bisilu ka buuxaan. 2
Oo wuxuu igu yidhi, Caamoosow, maxaad aragtaa? Oo
anna waxaan idhi, Waxaan arkaa dambiil midho bisilu ka
buuxaan. Markaasaa Rabbigu wuxuu igu yidhi, Dadkayga
Israa'iil dhammaadkoodii baa yimid, oo anigu mar dambe
iyaga iska dhaafi maayo. 3 Oo Sayidka Rabbiga ahu wuxuu
leeyahay, Maalintaas gabayada macbudku waxay ahaan
doonaan baroor, oo waxaa jiri doona meydad badan, oo
meel kasta aamusnaan baa loogu tuuri doonaa. 4 Bal maqla,
kuwiinna saboolka baahan liqow, oo xataa masaakiinta dalka
baabbi'iyow, 5 oo leh, Goormuu dayaxa cusubu dhammaan
doonaa aan hadhuudhka iibinnee? Sabtiduse goormay na
dhaafaysaa aannu sarreenka soo saarnee, idinkoo miisaanka
eefaah yaraynaya, oo miisaanka sheqelkana weynaynaya,
kafadahana khiyaano ku beenaynaya, 6 si aannu masaakiinta
lacag ugu iibsanno oo aannu saboolka baahanna laba
kabood u siisanno, oo aannu sarreenka xaabkiisa u iibinno? 7
Rabbigu waa ku dhaartay islaweynaanta reerka Yacquub, oo
wuxuu yidhi, Sida xaqiiqada ah anigu shuqulladooda midnaba
ka illoobi maayo. 8 Tan daraaddeed miyaan dhulku la gariiri
doonin, oo mid kasta oo degganuna miyuusan barooran
doonin? Haah, oo dhammaantiis wuxuu u kici doonaa sida
Webiga, oo wuu rogrogman doonaa, dabadeedna wuxuu u
degi doonaa sida Webiga Masar. 9 Oo Sayidka Rabbiga
ahu wuxuu leeyahay, Maalintaas waxaan ka dhigi doonaa
in qorraxdu hadhkii dhacdo, oo dhulkana maalin cad baan
gudcur ka dhigi doonaa. 10 Iidihiinnana waan u beddeli
doonaa tacsi, oo gabayadiinna oo dhanna baroorasho baan
u beddeli doonaa, oo waxaan ka dhigi doonaa in qof kasta
joonyad xidho oo madax kastana la xiiro, oo waxaan ka
dhigi doonaa sidii baroorasho wiil madi ah loogu baroorto,
oo dhammaadkeedana sidii maalin qadhaadh. 11 Sayidka
Rabbiga ahu wuxuu leeyahay, Bal eega, waxaa iman doona
wakhti aan dalka abaar u soo diri doono, mana ahaan doonto
abaar cunto la waayo ama biyo loo oomo, laakiinse waxay
ahaan doontaa abaar la waayayo erayada Rabbiga. 12 Oo
waxay wareegi doonaan bad ilaa ka bad, iyo woqooyi ilaa
tan iyo bari, oo waxay u ordi doonaan hore iyo dib iyagoo
doondoonaya erayga Rabbiga, oo mana ay heli doonaan
innaba. 13 Oo maalintaas ayaa bikradaha qurqurxoon iyo
barbaarraduba oon daraaddiis la itaal darnaan doonaan.
14 Kuwa ku dhaarta dembiga Samaariya oo yidhaahda,
Daanow, waxaan ku dhaartay ilaahaaga, oo waxaan ku
dhaartay jidka Bi'ir Shebac, way dhici doonaan oo mar
dambena sooma ay kici doonaan.

9 Waxaan arkay Sayidka oo ag taagan meesha allabariga,
oo wuxuu yidhi, Fayaaradaha garaac ilaa meelahooda
sare gariiraan, oo dadka oo dhan madaxooda ku wada jejebi,
oo intii ka hadhana seef baan ku layn doonaa. Midkoodna
ma carari doono, oo midkoodna ma baxsan doono. 2 Oo
xataa hadday hoos u qodaan ilaa She'ool, gacantaydaa
halkaas ka soo saari doonta, oo xataa hadday samada
fuulaan anigaa ka soo dejin doona halkaasna. **(Sheol h7585)** 3
Oo xataa hadday ku dhuntaan Buur Karmel dhaladeeda
anigaa halkaas ka baadhi doona oo ka soo bixin doona,
oo xataa hadday badda gunteeda iga dhuntaan, halkaasna
waan ka amri doonaa mas, oo isna wuu qaniini doonaa. 4 Oo
xataa hadday cadaawayaashooda maxaabiis ahaan u hor
socdaan, halkaasna seef baan ka amri doonaa, iyana way
layn doontaa, oo waxaan indhahayga iyaga ugu taagi doonaa
inaan belaayo ku sameeyo oo aanan wanaag u samayn.
5 Oo Sayidka Rabbiga ciidammada ahu waa kan dhulka
taabta oo dhulkuna wuu dhalaalaa, oo kuwa deggan oo
dhammuna way wada barooran doonaan, oo dhammaantiis
wuxuu u kici doonaa sida Webiga, dabadeedna wuxuu
u degi doonaa sida Webiga Masar. 6 Waa isaga kan
qolladihiisa sare samada ka dhistay, oo hoygiisa hoose
ee isku qabtana dhalka ku aasaasay, oo intuu biyaha
badda u yeedha dhulka korkiisa ku daadiya, magiciisuna
waa Rabbi. 7 Dadka Israa'iilow, sow aniga ilama mid
ahidin sida reer Itoobiya? ayaa Rabbigu leeyahay. Sow
anigu reer binu Israa'iil kama soo bixin dalkii Masar? Reer
Falastiinna sow kama soo bixin Kaftoor, reer Suuriyana
sow kama soo bixin Qiir? 8 Bal eega, Sayidka Rabbiga ah
indhihiisu waxay fiirinayaan Boqortooyadii dembi badan,
oo dhulkaan ka baabbi'in doonaa, laakiinse reer Yacquub
ma aan wada baabbi'in doono, ayaa Rabbigu leeyahay. 9
Waayo, bal eega, anigu waan amri doonaa, oo dadka Israa'iil
waan ku kala haadin doonaa quruumaha oo dhan, sida
hadhuudh xaadhin loogu haadiyo, laakiinse xabbad yaruna
dhulka kuma dhici doonto. 10 Dembilayaasha dadkayga
oo dhan oo leh, Belaayo na soo gaadhi mayso nana heli
mayso, dhammaantood seef bay ku dhiman doonaan.
11 Wakhtigaas waxaan sare kicin doonaa taambuuggii
Daa'uud oo dhacay, waanan awdi doonaa daldaloolkiisa,
oo jajabkiisana waan sare kicin doonaa, oo waxaan u dhisi
doonaa sidii waagii hore, 12 inay iyagu dhaxlaan kuwii
ka hadhay reer Edom iyo quruumaha magacayga loogu
yeedho oo dhan, ayaa Rabbiga waxan sameeya leeyahay.
13 Oo Rabbigu wuxuu leeyahay, Bal eega, waxaa iman
doona wakhti kan beerta falaa uu soo gaadhi doono kan
gooya, oo kan canabka ku tuntaana wuxuu soo gaadhi

doonaa kan iniinaha beera, oo buurahana waxaa ka soo
daadan doona khamri macaan, oo kuraha oo dhammuna
way wada dhalaali doonaan. 14 Oo anigu waxaan soo celin
doonaa maxaabiistii dadkayga Israa'iil, oo iyana way dhisi
doonaan magaalooyinkii baabba'ay, wayna degi doonaan,
oo beercanabyo way beeran doonaan, khamrigoodana
way cabbi doonaan, oo weliba waxay samaysan doonaan
beero, oo midhahooda way cuni doonaan. 15 Oo Rabbiga
Ilaahaaga ahu wuxuu leeyahay, Waxaan iyaga ku beeri
doonaa dalkoodii, oo mar dambena lagama rujin doono
dalkooda aan siiyey.

# Cobadyaah

1 Kuwanu waa wixii la tusay Cobadyaah. Sayidka Rabbiga
ahu sidan buu dalka Edom ka leeyahay: Annagu Rabbiga
xaggiisa ayaannu war ka maqalnay, oo farriinwade ayaa
quruumaha dhexdooda loo soo diray, isagoo leh, War kaca,
oo kaalaya aan dadka Edom dagaal ugu kacnee. 2 Bal eega,
quruumaha dhexdooda waan idinku yareeyey, oo si weyn
baa laydiin quudhsaday. 3 Kuwiinna qorarka dillaacyadooda
ku hoyda oo hoygoodu meesha sare ku yaal, waxaa idin
khiyaanay kibirka qalbigiinna, oo waxaad qalbiga iska
tidhaahdaan, Bal yaa dhulka nagu soo ridi kara? 4 In kastood
meel kore fuushaan sida gorgorka, iyo in kastoo buulkiinna
laga dhiso xiddigaha dhexdooda, halkaas waan idinka soo
dejin doonaa, ayaa Rabbigu leeyahay. 5 Haddii tuugag idiin
soo dhici lahaayeen ama haddii shufto habeennimo idin miri
lahayd, sow wax idinkama xadi lahayn jeeray wax ku filan
la tagaan? (Sidee baad u ba'deen!) Haddii kuwa canabka
gura idiin iman lahaayeen, sow kama tegi lahayn canab
xaaxaab ah? 6 Sidee baa loo dhacay alaabtii reer Ceesaw!
Oo khasnadihiisii qarsoonaa sidee baa loo baadhay! 7 Kulli
dadkii aad axdiga la lahaan jirteen oo dhammu waxay idinku
celiyeen tan iyo soohdinta, oo dadkii nabadda idinla lahaan
jiray ayaa idin khiyaanay, wayna idinka adkaadeen, oo
kuwii kibistiina cuni jiray ayaa dabin idiin dhigay, oo innaba
waxgarasho ma leh. 8 Rabbigu wuxuu leeyahay, Wakhtigaas
ragga xigmadda leh sow kama aan baabbi'in doono reer
Edom oo waxgarashadana sow kama baabbi'in doono buurta
Ceesaw? 9 Reer Teemaanow, raggiinna xoogga badanu
way wada nixi doonaan, oo sidaas daraaddeed mid kasta
oo buurta Ceesaw ka yimid ayaa laynta ku go'i doona.
10 Xumaantii aad walaalihiin reer Yacquub ku samayseen
aawadeed ayaa ceebu idiinku degi doonta, oo weligiin baad
go'naan doontaan. 11 Waayo, wakhtigii aad ag taagnaydeen
oo iska fiirinayseen, markay shisheeyayaashu maalkooda
qaadanayeen, oo dadka qalaad irdihooda soo gelayeen,
oo ay Yeruusaalem saamiga u ridanayeen, xataa idinku
iyagoo kalaad ahaydeen. 12 Laakiinse ha fiirina wakhtiga
walaalihiin cidhiidhiga ku jiraan, oo ha ku farxina wakhtiga
reer Yahuudah baabba'ooda, oo hana u faanina wakhtiga
cidhiidhiga. 13 Iridda dadkayga ha soo gelina wakhtiga
ay belaayaysan yihiin, oo weliba dhibkooda ha fiirsanina
wakhtiga ay belaayaysan yihiin, oo maalkoodana far ha
saarina wakhtiga ay belaayaysan yihiin. 14 Oo meesha
jidadka isku gooyaana ha u istaagina si aad u laysaan
kuwooda soo fakaday, oo kuwooda wakhtigii cidhiidhiga
ka hadhayna cadowgooda ha u gacangelina. 15 Waayo,
maalintii Rabbigu way soo dhow dahay oo way ku dhici
doontaa quruumaha oo dhan, oo sidaad samayseen ayaa
idinkana laydiinku samayn doonaa, oo abaalgudkiinnii ayaa
madaxiinna ku soo noqon doonaa. 16 Oo sidaad buurtayda
quduuska ah korkeeda wax ugu cabteen ayaa quruumaha
oo dhammuna had iyo goorba wax u cabbi doonaan, haah,
iyagu way cabbi doonaan oo way liqi doonaan, oo waxay
ahaan doonaan sidii iyagoo aan weligood ahaanin. 17
Laakiinse Buur Siyoon waxaa joogi doona kuwa baxsaday,
oo iyana quduus bay ahaan doontaa, oo reer Yacquubna
waxay lahaan doonaan waxyaalihii dhaxalkoodii ahaa. 18
Reer Yacquub dab buu ahaan doonaa, oo reer Yuusufna olol
buu ahaan doonaa, reer Ceesawna bal jajab ah buu ahaan
doonaa. Dhexdooday ku gubi doonaan oo iyagana way
laasan doonaan, oo reer Ceesawna innaba waxba kama
hadhi doonaan, waayo, Rabbigu sidaasuu ku hadlay. 19
Oo dadka koonfur degganu waxay hantiyi doonaan buurta
Ceesaw, oo kuwa bannaanka degganuna waxay hantiyi
doonaan dalka reer Falastiin, oo weliba waxay hantiyi
doonaan dalka reer Efrayim, iyo dalka reer Samaariya, oo
reer Benyaamiinna waxay hantiyi doonaan dalka Gilecaad. 20
Oo ciidankan dadka Israa'iil ee maxaabiista ahu waxay hantiyi
doonaan dalka reer Kancaan tan iyo Sarefta, oo Yeruusaalem
maxaabiisteeda Sefaaraad joogtaana waxay hantiyi doonaan
magaalooyinka koonfureed. 21 Oo badbaadiyayaaluna
waa iman doonaan Buur Siyoon, si ay buurta Ceesaw
u xukumaan, oo boqortooyadana waxaa lahaan doona
Rabbiga.

# Yoonis

1 Haddaba waxaa Yoonis ina Amitay u yimid Eraygii
Rabbiga oo sidan ku leh, 2 Kac, oo waxaad tagtaa
magaaladaas weyn oo Nineweh, oo iyada ku qayli, waayo,
sharkoodii wuxuu yimid hortayda. 3 Laakiinse Yoonis
wuxuu u kacay inuu Rabbiga hortiisa ka cararo oo xagga
Tarshiish u baxsado. Markaasuu Yaafaa u dhaadhacay oo
wuxuu halkaas ka helay doonni Tarshiish tegaysa. Sidaas
daraaddeed lacagtii nooliguu bixiyey, kolkaasuu gudaha
galay, waayo, wuxuu doonayay inuu iyaga Tarshiish u raaco
oo uu ka cararo Rabbiga hortiisa. 4 Laakiinse Rabbigu
wuxuu baddii ku soo daayay dabayl weyn, kolkaasaa waxaa
baddii ka dhex kacay duufaan xoog leh, doonnidiina waxay
ku dhowaatay inay burburto. 5 Markaasay raggii baxriyiinta
ahaa aad u baqeen, oo mid waluba wuxuu u qayshaday
ilaahiisii. Alaabtii doonnida ku jirtayna badday ku dhex
tuureen, si ay doonnidu iyaga ugu fududaato. Laakiinse
wuxuu Yoonis mar hore u dhaadhacay doonnida meesha
ugu hoosaysa, oo halkaasuu seexday, wuxuuna ku jiray
hurdo weyn. 6 Haddaba waxaa isagii u yimid naakhudihii
doonnida, oo ku yidhi, Hurdahayow, maxaad u jeeddaa?
Kac oo Ilaahaaga u qayli, waaba intaasoo uu inaga fikiraa
inaannan halligmine. 7 Oo wuxuu midba midkii kale ku
yidhi, Kaalaya aynu saami ridannee si aan u ogaanno kan
aawadiis belaayadanu inoogu dhacday. Sidaas daraaddeed
saami bay riteen, oo saamigiina wuxuu ku dhacay Yoonis.
8 Markaasay waxay isagii ku yidhaahdeen, Waannu ku
baryaynaaye noo sheeg kan aawadiis belaayadanu inoogu
dhacday. Waa maxay shuqulkaagu? Oo xaggee baad ka
timid? Waddankaagu waa kee? Dadkaaguna waa ayo? 9
Oo isna wuxuu iyagii ku yidhi, Waxaan ahay Cibraani, oo
waxaan ka cabsadaa Rabbiga ah Ilaaha samada, oo ah Kan
abuuray badda iyo berrigaba. 10 Markaasay nimankii aad
iyo aad u cabsadeen, oo ku yidhaahdeen, Waa maxay waxa
aad samaysay? Waayo, waxay ogaadeen inuu Rabbiga
hortiisa ka soo cararay, maxaa yeelay, isagaa u sheegay.
11 Markaasay ku yidhaahdeen, Si baddu noogu degto
aawadeed haddaba bal maxaannu kugu samaynaa? Waayo,
badda duufaankeedii aad iyo aad buu u sii weynaaday.
12 Oo isna wuxuu ku yidhi, Kor ii qaada oo badda igu
dhex tuura, sidaasay baddu idiinku degi doontaaye, waayo,
waxaan ogahay in duufaankan weynu daraadday idiinku
soo kacay. 13 Habase yeeshee nimankii aad bay seeb
doonnidii ugu wadeen oo ugu dadaaleen inay xeebtii ku
soo noqdaan, laakiinse way kari waayeen, maxaa yeelay,
badda duufaankeedii oo ka gees ahaa aad iyo aad buu u
sii weynaaday. 14 Markaasay Rabbiga u qayshadeen, oo
waxay ku yidhaahdeen, Rabbiyow, waannu ku baryaynaa,
oo waannu ku baryaynaaye, yaannan u halligmin nolosha
ninkan aawadeed, oo annaga ha na saarin dhiig aan xaq
qabin, waayo, Rabbiyow, waxaad samaysay sidii aad ku
faraxday. 15 Sidaas daraaddeed Yoonis bay kor u qaadeen
oo waxay ku dhex tuureen baddii, kolkaasay baddii joojisay
cadhadeedii. 16 Markaasay nimankii aad iyo aad Rabbiga
uga cabsadeen, oo waxay Rabbiga u bixiyeen allabari,
nidarrona way galeen. 17 Oo Rabbigu wuxuu Yoonis u
diyaariyey kalluun weyn oo isaga liqa; Yoonisna wuxuu
kalluunka calooshiisii ku dhex jiray saddex habeen iyo
saddex maalmood.

2 Markaasaa Yoonis Rabbigii Ilaahiisa ahaa baryay, isagoo
ku dhex jira calooshii kalluunka. 2 Oo wuxuu yidhi,
Dhibaatadayda aawadeed ayaan Rabbiga ugu yeedhay,
Isna wuu ii jawaabay. Waxaan ka dhex qayliyey She'ool
uurkiisa, Adna codkaygaad maqashay. **(Sheol h7585)** 3 Waayo,
waxaad igu dhex tuurtay moolka iyo badda uurkeeda.
Hareerahaygana waxaa ku wareegsanaa daad, Hirarkaagii
iyo mawjadahaagii oo dhammuna way i dul mareen. 4
Kolkaasaan idhi, Indhahaaga hortooda waa layga tuuray;
Welise waxaan mar kale eegayaa macbudkaaga quduuskaa.
5 Biyihii way i hareerayeen xataa naftayda, Moolkiina wuu igu
wareegsanaa; Madaxaygana waxaa ku duudduubnaa caws
badeed. 6 Waxaan hoos ugu dhaadhacay buuraha guntooda;
Oo weligay waxaa i awday dhulkii iyo gudbayaashiisiiba;
Laakiinse, Rabbiyow, Ilaahayow, noloshaydii waxaad ka soo
bixisay yamayskii. 7 Markii naftaydu itaal darnaatay ayaan
ku xusuustay, Rabbiyow; Oo baryadaydii adigay kuu timid,
oo waxay kuugu soo gashay macbudkaaga quduuskaa.
8 Kuwa waxyaalaha beenta ah oo aan micne lahayn ku
fikiraa Waxay ka tagaan naxariistoodii. 9 Aniguse codka
mahadnaqidda ayaan allabari kuugu bixin doonaa; Wixii aan
nidrayna waan bixinayaa. Badbaado waxaa leh Rabbiga. 10
Markaasuu Rabbigu kalluunkii amray, kalluunkiina wuxuu
Yoonis ku mantagay berriga.

3 Haddana mar labaad ayaa eraygii Rabbigu u yimid Yoonis
oo ku yidhi, 2 Kac, oo waxaad tagtaa magaaladaas weyn
oo Nineweh, oo waxaad iyada ku wacdidaa wacdiska aan
kuu sheegayo, 3 Sidaas daraaddeed Yoonis wuu kacay
oo wuxuu tegey Nineweh siduu eraygii Rabbigu ku amray.
Haddaba Nineweh waxay ahayd magaalo aad iyo aad u
weyn, oo waxay isu jirtay intii saddex maalmood loo socdo.
4 Markaasaa Yoonis wuxuu bilaabay inuu magaaladii dhex
galo in maalin socod ah, oo intuu qayliyey ayuu yidhi, Weli

waxaa u hadhay afartan maalmood, dabadeedna Nineweh
waa la afgembiyi doonaa. 5 Markaasaa dadkii Nineweh
Ilaah rumaysteen, oo waxay ku dhawaaqeen in la soomo,
oo kii ugu wada weynaa ilaa kii ugu yaraa inta ka dhex leh
waxay wada xidheen dhar joonyad ah. 6 Oo warkiina wuxuu
gaadhay boqorkii Nineweh, oo isna intuu carshigiisii ka
kacay ayuu dharkiisii quruxdasanaa iska bixiyey, oo wuxuu
huwaday dhar joonyad ah, dambasna wuu ku fadhiistay. 7
Oo wuxuu sameeyey naado, oo Nineweh gudaheeda ayaa
lagu faafiyey amarkii boqorka iyo saraakiishiisa oo leh, Dad
iyo duunyo, lo' iyo ido toona, yaan midna wax dhadhamin,
oo yaanay wax cunin, biyona cabbin. 8 Laakiinse dad iyo
duunyoba dhar joonyad ah ha la wada huwado, oo Ilaah
xaggiisa aad ha loogu qayliyo; oo mid kastaaba ha ka leexdo
jidkiisii xumaa iyo dulmiga gacmihiisa ku jira. 9 Bal yaa
og in Ilaah ka noqon doono oo cadhadiisa kulul ka jeesan
doono iyo in kale, si aynaan u halligmin? 10 Oo markaasaa
Ilaah wuxuu arkay shuqulkoodii iyo inay iyagu ka noqdeen
jidkoodii xumaa, kolkaasaa Ilaah wuxuu ka noqday sharkii
uu sheegay inuu iyaga ku samaynayo; oo taasna ma uu
samayn.

4 Laakiinse Yoonis taas aad buu uga calool xumaaday,
wuuna xanaaqay. 2 Kolkaasuu wuxuu baryay Rabbiga
oo ku yidhi, Rabbiyow, waan ku baryayaaye, sow kanu
ma aha hadalkii aan idhi intaan weli dalkaygii joogay? Oo
taas daraaddeed ayaan u degdegay si aan xagga Tarshiish
ugu cararo, waayo, waan ogaa inaad tahay Ilaah nimco
miidhan ah, oo raxmadu ka buuxdo, oo cadhada u gaabiya,
oo naxariis badan, iyo inaad sharka ka noqotid. 3 Haddaba
sidaas daraaddeed, Rabbiyow, waan ku baryayaaye naftayda
iga qaad, waayo, intii aan noolaan lahaa waxaa iiga roon
inaan dhinto. 4 Markaasaa Rabbigu wuxuu ku yidhi, War
inaad xanaaqdid ma kuu wanaagsan tahay? 5 Markaasaa
Yoonis ka baxay magaaladii, oo wuxuu fadhiistay magaalada
dhankeedii bari, oo halkaasuu waab ka dhistay. Markaasuu
hadhkii hoos fadhiistay ilaa uu arko waxa magaalada ku
dhacaya. 6 Kolkaasaa Rabbigu wuxuu diyaariyey geed ubbo
ah, oo wuxuu ka dhigay inuu kor fuulo waabkii Yoonis, si
uu hoos ugu noqdo, oo uu uga samatabbixiyo xaalkiisii
xumaa. Sidaas daraaddeed Yoonis aad iyo aad buu ugu
farxay geedkii ubbada ahaa aawadiis. 7 Laakiinse maalintii
dambe markii waagii beryay ayaa Ilaah diyaariyey dixiri, oo
isna geedkii ubbada ahaa ayuu gooyay ilaa uu engegay. 8
Oo kolkii qorraxdii soo baxday ayaa Ilaah diyaariyey dabayl
kulul oo bari ka timid; qorraxdiina Yoonis ayay madaxa
kaga dhegtay ilaa uu itaal darnaaday, oo isna wuxuu ku
baryootamay inuu dhinto, oo wuxuu yidhi, Intii aan noolaan
lahaa waxaa iiga roon inaan dhinto. 9 Markaasaa Ilaah
wuxuu Yoonis ku yidhi, War inaad geedkii ubbada ahaa u
xanaaqdid ma kuu wanaagsan tahay? Oo isna wuxuu yidhi,
Haah, oo inaan cadhoodo way ii wanaagsan tahay xataa ilaa
dhimasho. 10 Markaasaa Rabbigu wuxuu ku yidhi, Waxaad
u jixinjixday geedkii ubbada ahaa oo aadan u hawshoon
oo aadan korinin oo habeen iska soo baxay oo habeen
ku baabba'ay. 11 Haddaba sow iima eka inaan u jixinjixo
magaalada weyn oo Nineweh, taasoo ay gudaheeda ku
jiraan dad ka badan boqol iyo labaatan kun oo qof oo aan
kala garan karin gacantooda midig iyo gacantooda bidix, iyo
weliba xoolo badan?

# Miikaah

**1** Kanu waa Eraygii Rabbiga oo u yimid Miikaah kii reer
Mooreshed waagii ay Yootam iyo Aaxaas iyo Xisqiyaah
boqorrada ka ahaayeen dalka Yahuudah, oo uu ku arkay
wax ku saabsan Samaariya iyo Yeruusaalem. 2 Dadyowga
oo dhammow, kulligiin maqla. Dhulka iyo waxa ku jira oo
dhammow, bal dhegaysta, oo Sayidka Rabbiga ahu ha idinku
marag furo, Sayidku macbudkiisa quduuska ah ha idinkaga
marag furo. 3 Waayo, bal eega, Rabbigu meeshiisuu ka soo
bixi doonaa, wuuna soo degan doonaa, oo dhulka meelihiisa
sarsare mari doonaa. 4 Oo buuruhu hoostiisay ku dhalaali
doonaan, dooxooyinkuna way u kala dildillaaci doonaan sidii
shamac dab hor yaal, iyo sidii biyo ka daadanaya meel sare.
5 Waxan oo dhammu waxay u dheceen xadgudubka reer
Yacquub iyo dembiyada dadka Israa'iil. Xadgudubka reer
Yacquub waa maxay? Sow Samaariya ma aha? Meelaha
sare oo dalka Yahuudahna waa maxay? Sow Yeruusaalem
ma aha? 6 Haddaba sidaas daraaddeed waxaan Samaariya
ka dhigi doonaa sidii taallo burbur ah oo duurka ku taal,
iyo sidii meel beercanab laga beerto, oo dhagxanteedana
waxaan ku dhex daadin doonaa dooxada, oo aasaaskeedana
waan soo bannayn doonaa. 7 Taswiiraheeda xardhan oo
dhan waa la wada burburin doonaa, oo kirooyinkeeda oo
dhanna dab baa lagu gubi doonaa, oo sanamyadeeda oo
dhanna waan wada baabbi'in doonaa, waayo, iyadu waxay ku
soo urursatay dhillo kiradeed, oo kulligoodna waxay dib ugu
noqon doonaan dhillo kiradeed. 8 Haddaba taas daraaddeed
ayaan u ooyi doonaa oo u barooran doonaa, oo anoo
cago cad oo qaawan ayaan wareegi doonaa, oo waxaan u
dhawaaqi doonaa sida dawacooyinku u ciyaan oo kale, oo
waxaan u qaylin doonaa sida goroyadu u cido oo kale. 9
Waayo, nabraheedu ma bogsan karaan, oo xataa waxay
soo gaadheen dalka Yahuudah, oo waxay soo gaadheen
xataa iridda dadkayga taasoo ah Yeruusaalem. 10 Gad ha ku
dhex sheegina, hana ooyina, oo Beytlecafraah dhexdeeda
boodhka ku galgasha. 11 Kaaga Shaafiir degganow, bax
adoo qaawan oo ceebaysan. Kan Sa'anaan degganu soo
ma bixin. Barooorta Beytesel waxay idinka qaadan doontaa
meesha aad ku tiirsato. 12 Waayo, kan Maarood degganu
aad buu u sugayaa wanaag, maxaa yeelay, belaayo baa
xagga Rabbiga ka soo degtay, oo waxay soo gaadhay iridda
Yeruusaalem. 13 Kan Laakiish degganow, gaadhiga ku
dhuuji faraska dheereeya. Laakiish waxay dadka Siyoon u
ahayd bilowgii dembiga, maxaa yeelay, xadgudubyadii dadka
Israa'iil ayaa laga dhex helay. 14 Haddaba sidaas daraaddeed
waxaad Mooreshed Gad siin doontaa hadiyado. Reeraha
Aksiib waxay boqorrada dalka Israa'iil u noqon doonaan
wax khiyaano badan. 15 Kan Maareeshaah degganow, weli
waxaan kuu keeni doonaa kan ku hantiyi doona. Dalka
Israa'iil sharaftiisu waxay gaadhi doontaa xataa tan iyo
Cadullaam. 16 Xiiro oo timahaaga iska jar carruurtaadii
aad jeclayd daraaddood, oo intaad xiirata sii ballaadhi sida
bidaarta gorgorka oo kale, waayo, iyagu way kaa tageen, oo
waxaa loo kaxaystay maxaabiis ahaan.

**2** Waxaa hoogay kuwa xumaanta ka fikira oo waxyaalaha
sharka ah sariirahooda ku hindisa. Markii waagu beryo
ayay sameeyaan, maxaa yeelay, taas gacantooda baa
xoog u leh. 2 Oo waxay damcaan beero, kolkaasay xoog
ku qabsadaan, oo waxay damcaan guryo oo way iska
qaataan, oo waxay dulmaan nin iyo reerkiis, iyo xataa nin iyo
dhaxalkiis. 3 Haddaba sidaas daraaddeed Rabbigu wuxuu
leeyahay, Bal eega, waxaan hindisay belaayo qoyskan ka
gees ah, taas oo aydaan surkiinna kala bixi doonin, oo weliba
si kibir leh uma socon doontaan, waayo, waa wakhti xun. 4
Wakhtigaas waxaa laydinku qaadi doonaa masaal, waxaa
lagu barooran doonaa baroor aad u weyn, oo waxaa la odhan
doonaa, Annaga waa nala wada baabbi'iyey. Isagu waa
beddelaa qaybtii dadkayga. Bal sidee buu iiga wareejiyaa!
Oo beerahayagiina wuxuu u qaybiyaa caasiyiinta. 5 Sidaas
daraaddeed ururka Rabbiga dhexdiisa kuma lahaan doontid
mid wax ku qiyaasa xadhigga saamiga. 6 Waxay iyagu
ku yidhaahdaan, Waxba ha sii sheegina. Iyagu kuwan
waxba uma sii sheegi doonaan. Oo hadallo cay ah kama
dhammaan doonaan. 7 Reer Yacquubow, ma waxaa la odhan
doonaa, Ruuxii Rabbigu miyuu soo dulqaadasho yaraaday?
Kuwanuse ma falimihiisii baa? Miyaan erayadaydu wax
wanaagsan u tarin kii si qumman u socda? 8 Laakiinse
waayahan dambeba dadkaygii wuxuu u kacay sidii cadow
oo kale. Waxaad marada ka saartaan dharka dadka jidka
ammaan ku maraya sidii kuwa dagaal ka noqda. 9 Dumarkii
dadkayga waxaad ka saartaan guryahoodii wacnaa, oo
carruurtoodii yaryaraydna waxaad weligiin ka qaadataan
ammaantaydii. 10 Sara joogsada oo taga, waayo, tanu ma
aha nasashadiinna, maxaa yeelay, waxaa jirta wasakh wax
ku baabbi'inaysa baabba' xoog badan. 11 Nin dabayl iyo
khiyaano ku dhex socda hadduu been sheego oo yidhaahdo,
Waxaan wax kaaga sii sheegayaa khamri iyo wax lagu
sakhraamo, xataa kaasu nebi buu dadkan u noqon doonaa.
12 Reer Yacquubow, sida xaqiiqada ah dhammaantiin waan
soo wada shirin doonaa, sida xaqiiqada ah waxaan soo
ururin doona kuwa dadka Israa'iil ka hadhay, oo waxaan
iyaga isugu wada keeni doonaa sidii idihii Bosraah, sidii adhi

daaqsiintiisii ku dhex jira, oo dadkooda badan daraaddiis
aad bay u buuqi doonaan. 13 Kan wax jebiyo ayaa hortood
tegey. Way soo fara baxsadeen oo waxay u gudbeen xagga
iridda, oo halkaasay ka bexeen, oo boqorkoodiina hortooduu
maray, oo Rabbiguna waa kan madax u ah.

3 Oo anigu waxaan idhi, Waan idin baryayaaye madaxda
reer Yacquub iyo taliyayaasha dalka Israa'iilow, i maqla.
Sow idinkuma habboona inaad caddaaladda taqaanniin? 2
Idinku wanaagga waad neceb tihiin oo sharkaad jeceshihiin,
oo haraggoodana waad ka mudhxisaan, oo hilibkoodana
lafahooda waad ka mudhxisaan. 3 Oo weliba waxaad cuntaan
hilibka dadkayga, oo haraggoodana waad ka siibtaan, oo
lafahoodana waad jejebisaan, haah, oo waxaad u kala
gogooysaan sidii hilib dheri loo diyaariyo, iyo sidii hilib digsi
ku jiro. 4 Markaasay Rabbiga u qayshan doonaan, laakiinse
isagu uma uu jawaabi doono, oo weliba wakhtigaas wejigiisa
wuu ka qarin doonaa, waana sidii ay iyagu falimahooda
xumaanta ugu sameeyeen. 5 Rabbigu sidaasuu kaga
leeyahay nebiyada dadkayga qalda, oo qaniina oo haddana
ku qayliya, Nabad, oo ku dhawaaqa in lala diriro ku alla kii aan
afkooda wax ku ridin. 6 Haddaba sidaas daraaddeed waxay
idiin noqon doontaa habeen, waxbana laydinma tusi doono,
oo waxay idiin noqon doontaa gudcur, mana aad faalan
doontaan, oo qorraxdu way dhici doontaa nebiyada oo jooga,
oo maalintuna way ku madoobaan doontaa iyaga. 7 Oo
kuwa wax arka way ceeboobi doonaan, oo faaliyayaashuna
way isku wareeri doonaan, haah, oo dhammaantood waxay
dabooli doonaan bushimahooda, waayo, ma jirto jawaab
Rabbiga ka timid. 8 Laakiinse sida runta ah aniga waxaa
iga buuxa xoog iyo caddaalad iyo itaal uu Ruuxa Rabbigu i
geliyey si aan reer Yacquub xadgudubkiisa ugu sheego,
oo aan dadka Israa'iil dembigiisa ugu sheego. 9 Madaxda
reer Yacquub iyo taliyayaasha dalka Israa'iilow, waan idin
baryayaaye, waxan maqla, kuwiinna caddaaladda neceb oo
qummanaanta qalloociya. 10 Siyoon dhiig bay ku dhisaan,
Yeruusaalemna xumaan bay ku dhisaan. 11 Madaxdoodu
laaluush bay wax ku xukumaan, wadaaddadooduna kiro
bay dadka wax ku baraan, oo nebiyadooduna lacag bay
u faaliyaan, oo weliba Rabbiga bay ku tiirsadaan iyagoo
leh, Sow Rabbigu dhexdayada ma joogo? Belaayo innaba
naguma degi doonto. 12 Haddaba sidaas daraaddeed idinka
aawadiin Siyoon waxaa loo jeexi doonaa sida beer oo kale,
oo Yeruusaalemna waxay noqon doontaa taallooyin burbur
ah, oo buurta guriguna waxay noqon doontaa sida meelaha
sare ee kaynta ku yaal oo kale.

4 Laakiinse ugu dambaysta buurta guriga Rabbigu waxay
ka taagnaan doontaa buuraha korkooda, oo kurahana
way ka wada sara mari doontaa, oo dadyowguna iyaday
u sii qulquli doonaan. 2 Oo quruumo badan baa halkaas
tegi doona oo waxay odhan doonaan, Ina keena, oo aynu u
kacno buurta Rabbiga, oo aynu tagno guriga Ilaaha reer
Yacquub, oo isna wuxuu ina bari doonaa jidadkiisa, oo innana
waxaynu mari doonnaa waddooyinkiisa, waayo, sharcigu
wuxuu ka soo bixi doonaa Siyoon, erayga Rabbiguna
Yeruusaalem. 3 Oo isaguna dadyow badan buu u kala
garsoori doonaa, oo quruumaha xoogga badan oo meel fog
joogana wuu canaanan doonaa, oo iyana waxay seefahooda
ka tuman doonaan marashiyo, warmahoodana manjooyin,
oo quruunina quruun kale seef uma qaadan doonto, oo
innaba mar dambe dagaal ma ay baran doonaan. 4
Laakiinse ninkood waluba wuxuu hoos fadhiisan doonaa
geedkiisa canabka ah, iyo geedkiisa berdaha ah, oo ninna
ma cabsiin doono iyaga, waayo, afkii Rabbiga ciidammada
ayaa saas ku hadlay. 5 Waayo, dadyowga oo dhan mid
kastaaba wuxuu ku socon doonaa magaca ilaahiisa, oo
annaguna waxaannu ku socon doonnaa magaca Rabbiga
Ilaahayaga ah weligayo iyo weligayoba. 6 Rabbigu wuxuu
leeyahay, Wakhtigaas waxaan soo shirin doonaa kuwa
dhutiya, oo waxaan soo ururin doonaa kuwa la eryay iyo
kuwa aan dhibay. 7 Oo kuwii dhutin jiray waxaan ka dhigi
doonaa kuwa hadhay, oo kuwa meesha fog lagu tuurayna
waxaan ka dhigi doonaa quruun xoog badan, oo Rabbigu
iyaguu ugu talin doonaa Buur Siyoon hadda dabadeed
iyo tan iyo weligeedba. 8 Oo kaaga munaaradda adhiga
ahow, oo buurta dadka Siyoon ahow, adigay kuu iman
doontaa, xukumaadda hore way kuu iman doontaa, taasoo
weliba ah boqortooyada dadka Yeruusaalem. 9 Haddaba
bal maxaad u musannaabaysaa? Sow boqor kuma dhex
joogo? Mase taliyahaagii baa halligmay? Oo ma sidaas
daraaddeed baa xanuun ku qabtay sidii naag foolanaysa? 10
Magaalada Siyoonay, xanuunso, oo foolo aad dhashide sida
naag foolanaysa, waayo, hadda ayaad magaalada ka bixi
doontaa, oo waxaad degganaan doontaa duurka, oo xataa
waxaad tegi doontaa Baabuloon, oo halkaas ayaa lagaa
soo samatabbixin doonaa, oo halkaas ayaa Rabbigu kaaga
soo furan doona gacanta cadaawayaashaada. 11 Oo hadda
waxaa kaa shiray quruumo badan, oo waxay yidhaahdaan,
Ha nijaasowdo, oo indhahayagu Siyoon ha fiiriyeen. 12
Laakiinse iyagu ma ay yaqaaniin Rabbiga fikirradiisa, mana
ay gartaan taladiisa, waayo, isagu wuxuu iyaga u ururshay
sidii xidhmooyin loo wada meesha hadhuudhka lagu tumo.
13 Magaalada Siyoonay, sara joogso, oo wax tun, waayo,

geeskaaga waxaan ka dhigi doonaa bir, oo qoobabkaagana
waxaan ka dhigi doonaa naxaas, oo adna dadyow badan
baad burburin doontaa oo faa'iidadooda waxaad gooni u
sooci doontaa Rabbiga, oo maalkoodana waxaad gooni u
sooci doontaa Sayidka adduunka oo dhan.

5 Ciidammadoy, hadda waa inaad isa soo urursataan.
Isagu waa inoo hareereeyey. Xaakinka dalka Israa'iil
ul bay dhabanka kaga dhufan doonaan. 2 Laakiinse
adigu Beytlaxam Efraataahay in kastoo aad ku yar tahay
kumanyaalka reer Yahuudah, waxaa adiga iiga kaa soo bixi
doona mid dalka Israa'iil taliye ka noqon doona, kaasoo
bixitinkiisu ahaa waa hore, iyo tan iyo weligiis. 3 Haddaba
sidaas daraaddeed iyaguu gacangelin doonaa jeeray tan
foolanaysa umusho, dabadeedna kuwa walaalihiis ka hadhay
waxay ku noqon doonaan dadka Israa'iil. 4 Oo isagu wuu
istaagi doonaa, oo wuxuu adhigiisa ku daajin doonaa xoogga
Rabbiga iyo haybadda magaca Rabbiga Ilaahiisa ah, oo
iyana ammaan bay ku joogi doonaan, waayo, isagu haatan
mid weyn buu ku ahaan doonaa tan iyo dhulka darfihiisa.
5 Oo kanu wuxuu noqon doonaa nabaddeenna. Markii
kan reer Ashuur uu dalkeenna soo galo, oo uu ku dhex
socdo daaraheenna waaweyn, markaasaynu isaga ku kicin
doonnaa toddoba adhijir iyo siddeed nin oo madax ah. 6 Oo
dalka Ashuur seef baa lagu dumin doonaa, oo dalka reer
Nimrod waa laga dumin doonaa irdaha laga galo, oo isagu
wuxuu inaga samatabbixin doonaa kan reer Ashuur markuu
dalkeenna soo galo iyo markuu soohdinteenna dhex maro. 7
Oo kuwa reer Yacquub ka hadhayna waxay dadyow badan ku
dhex ahaan doonaan sidii sayax xagga Rabbiga ka yimid, iyo
sidii shuxshux caws ku kor da'ay, kaasoo aan ninna dhawrin,
oo aan binu-aadmiga sugin. 8 Oo kuwa reer Yacquub ka
hadhayna waxay quruumaha dhexdooda iyo dadyow badan
dhexbadhtankooda joogi doonaan sidii libaax ku dhex jira
xayawaanka kaynta, iyo sidii aaran libaax oo ku dhex jira
ido foof ah, kaasoo markuu dhex maraaba ku tunta oo kala
jeexjeexda, oo weliba aan la arag mid ka samatabbixiya. 9
Gacantiinnu ha ka sarrayso cadaawayaashiinna, oo colkiinna
oo dhanna ha wada baabbo'o. 10 Oo Rabbigu wuxuu
leeyahay, Wakhtigaas fardihiinna waan idinka dhex baabbi'in
doonaa, oo gaadhifardoodkiinnana waan wada jejebin
doonaa. 11 Oo magaalooyinka dalkiinna waan baabbi'in
doonaa, oo qalcadihiinnana waan wada dumin doonaa. 12
Oo gacantiinnana sixir waan ka baabbi'in doonaa, oo mar
dambena ma lahaan doontaan faaliyayaal. 13 Oo waxaan
dhexdiinna ka baabbi'in doonaa taswiirahiinna xardhan iyo
tiirarkiinna, oo mar dambe ma aad caabudi doontaan sancada
gacmihiinna. 14 Oo dhexbadhtankiinna waan ka rujin doonaa
geedihiinna Asheeraah ah, oo magaalooyinkiinnana waan
wada dumin doonaa. 15 Oo quruumihii aan i dhegaysan
waxaan kaga aargoosan doonaa xanaaq iyo cadho.

6 Haddaba maqla waxa Rabbigu leeyahay, Sara joogsada,
dacwaddiinna buuraha ku hor sheegta, oo kuruhuna
codkiinna ha maqleen. 2 Buuraha iyo dhulka aasaasyadiisa
warayow, Rabbiga dacwaddiisa maqla, waayo, Rabbigu
dacwad buu la leeyahay dadkiisa, oo wuxuu la muddici
doonaa dadka Israa'iil. 3 Dadkaygiiyow, bal maxaan idinku
sameeyey? Maxaanse idinku daaliyey? Haddaba bal igu
markhaatifura. 4 Waayo, dalkii Masar waan idinka soo
bixiyey, oo guriga addoonsiga waan idinka soo furtay, oo
waxaan idin hor mariyey Muuse, iyo Haaruun iyo Maryan. 5
Dadkaygiiyow, bal haatan soo xusuusta wixii uu Baalaaq oo
ahaa boqorkii Moo'aab ku tashaday, iyo wixii u Balcaam
ina Becoor ugu jawaabay, bal soo xusuusta wixii dhacay
tan iyo Shitiim iyo ilaa Gilgaal, si aad ku ogaataan falimaha
xaqa ah ee Rabbiga. 6 Bal maxaan Rabbiga hortiisa la
imaadaa? Oo sidee baan Ilaaha sare ugu hor sujuudaa?
Ma qurbaanno la gubo baan Rabbiga hortiisa la imaadaa?
Ma weylo gu jira baan la imaadaa? 7 Rabbigu ma ku
farxaa kumanyaal wanan, amase toban kun oo webi oo
saliid ah? Xadgudubkayga aawadiis miyaan curadkayga
u bixiyaa? Dembigii naftaydase ma midhaha jidhkaygaan
u bixiyaa? 8 Nin yahow, Rabbigu wuxuu ku tusay waxa
wanaagsan. Oo bal maxaa Rabbigu kaa doonayaa, inaad
caddaaladda samaysid, oo aad naxariista jeclaatid, oo aad
si hoosaysa Ilaahaaga ula socotid mooyaane? 9 Codkii
Rabbigu magaalada buu u qaylinayaa, oo ninkii xigmad lahu
magacaaga buu ka cabsan doonaa. Idinku usha maqla iyo
kan soo dirayba. 10 Guriga sharowga weli miyey yaalliin
khasnadihii sharnimadu iyo weliba qiyaastii dhimanayd oo
karaahiyada ahayd? 11 Miyaan daahir ahaanayaa anoo
haysta kafado xun iyo kolay miisaanno khiyaano miidhan
ah? 12 Waayo, dadkeeda taajiriinta ahu waa dulmi miidhan,
oo kuweeda degganuna been bay ku hadlaan, oo carrabka
afkooduna waa khiyaano miidhan. 13 Haddaba sidaas
daraaddeed dhaawac aad u xun baan idinku dhuftay, oo
dembigiinna aawadiis cidla baan idinka dhigay. 14 Wax
baad cuni doontaan mase dhergi doontaan. Gaajadiinnu
dhexdiinnay ku jiri doontaa. Wax baad kaydin doontaan,
laakiinse sinaba uma aad nabad gelin doontaan, oo wixii aad
nabadgelisaanna seef baan u gacangelinayaa. 15 Wax baad
beeran doontaan mase goosan doontaan, oo saytuunka
waad tuman doontaan laakiinse saliiddiisa kuma subkan

doontaan, oo canabkana waad tuman doontaan laakiinse
khamrigiisa ma cabbi doontaan. 16 Waayo, qaynuunnadii
Boqor Coomrii iyo shuqulladii reer Boqor Axaab oo dhanba
waad dhawrteen, oo waxaad ku socotaan talooyinkoodii, si
aan cidla laga yaabo idiinka dhigo, oo dadka magaaladiinna
degganna waxaan ka dhigi doonaa wax lagu foodhyo, oo
idinku waxaad qaadan doontaan cayda dadkayga.

7 Anaa iska hoogay! Waayo, waxaan ahay sidii marka la
soo ururiyo midhaha beergoosadka, iyo sida xaabxaabka
canabka. Ma jiro rucub la cuna. Naftaydu waxay doonaysaa
berdaha hore u bislaaday. 2 Dadkii cibaadada lahaa wuu ka
wada baabba'ay dhulka, oo dadka dhexdiisa laguma arko
mid qumman. Kulligood waxay u wada gabbadaan inay dhiig
galaan daraaddeed, oo nin kastaaba walaalkiis ayuu shabag
ku ugaadhsadaa. 3 Gacmahoodu waxay aad ugu dadaalaan
inay sameeyaan wax shar ah. Amiirka iyo xaakinkuba waxay
dadka weyddiistaan laaluush. Ninka weynuna wuxuu ku
hadlaa xumaanta naftiisu doonayso, oo sidaasay isugu
maroojiyaan xumaan. 4 Kooda ugu wanaagsanu waa
sidii qodxan oo kale, kooda ugu wada qummanuna waa
sidii yamaarug oo kale. Wakhtigii waardiyihiinna oo ah
wakhtigii laydin soo booqan lahaa waa yimid, wareerkoodu
hadduu noqon doonaa. 5 Deris ha isku hallaynina, saaxiibna
ha ku kalsoonaanina, afkaagana ka xidho tan laabtaada
ku jiifta. 6 Waayo, wiil wuxuu sharafjebiyaa aabbihiis,
gabadhuna waxay ku kacdaa hooyadeed, oo naaguna waxay
ku kacdaa soddohdeed, oo nin cadowgiisuna waa dadka
gurigiisa. 7 Laakiinse anigu Rabbigaan dhawrayaa, oo
Ilaaha badbaadadayda waan sugayaa. Ilaahay wuu i maqli
doonaa. 8 Cadowgaygow, ha igu farxin. Goortaan dhoco
waan kici doonaa, oo goortaan gudcur fadhiistana Rabbiga
ayaa iftiin ii noqon doona. 9 Anigu waan qaadan doonaa
Rabbiga dhirifkiisa, maxaa yeelay, waan ku dembaabay
isaga, ilaa uu dacwaddayda ii muddaco, oo uu ii garsooro.
Iftiinka wuu ii soo bixin doonaa, oo anna xaqnimadiisa
waan arki doonaa. 10 Dabadeedna waxaa arki doonta tan
cadowgayga ah, oo aad bay u ceeboobi doontaa tan igu
lahayd, Meeh Rabbiga Ilaahaaga ah? Indhahaygu way
fiirin doonaan iyada, oo haatan waxaa iyada loogu tuman
doonaa sidii dhoobada jidadka dhex taal. 11 Waxaa iman
doona wakhti derbiyadiinna la dhisi doono, oo wakhtigaas
ayaa soohdintiinna la ballaadhin doonaa. 12 Wakhtigaas
waxaa laydiinka iman doonaa tan iyo dalka Ashuur iyo
ilaa magaalooyinka Masar, iyo tan iyo Masar iyo ilaa Webi
Yufraad, iyo tan iyo bad ilaa baddeeda kale, iyo buur
iyo ilaa buurteeda kale. 13 Laakiinse dhulku cidla buu
noqon doonaa, waana kuwa dhex deggan daraaddood iyo
midhihii falimahooda aawadood. 14 Dadkaaga oo ah adhigii
dhaxalkaaga oo kaynta Karmel ku dhex taal keli ahaantood
deggan ushaada ku daaji. Iyagu ha daaqeen Baashaan
iyo Gilecaad sidii waagii hore. 15 Sidii wakhtigii aad dalkii
Masar ka soo baxdeen ayaan waxyaalo yaab badan tusi
doonaa. 16 Quruumuhu way arki doonaan, oo waxay ka
ceeboobi doonaan itaalkooda oo dhan, oo intay gacanta
afka saaraan ayay dhego beeli doonaan. 17 Waxay ciidda u
leefleefi doonaan sidii abeeso oo kale, sidii waxyaalo dhulka
ku gurguurta ayay iyagoo gariiraya meelahooda ka soo
bixi doonaan, oo waxay cabsi ugu iman doonaan Rabbiga
Ilaaheenna ah, oo idinka aawadiin ayay u baqi doonaan.
18 Bal waa kee Ilaaha kula mid ahi, kaasoo xumaanta
saamaxa, oo iska dhaafa xadgudubka kuwa dhaxalkiisa ka
hadhay? Isagu sii ma cadhaysnaado weligiis, maxaa yeelay,
naxariistuu ku farxaa. 19 Isagu wuu soo jeedsan doonaa oo
wuu inoo naxariisan doonaa. Xumaanteennana cagta buu
kula joogsan doonaa. Adigu dembiyadooda oo dhan waxaad
ku tuuri doontaa badda moolkeeda. 20 Sidaad waagii hore
awowayaashayo ugu dhaaratay, waxaad Yacquub u samayn
doontaa run, Ibraahimna naxariis.

# Naxuum

1 Kanu waa warka culus oo Nineweh ku saabsan. Oo waa
kitaabkii waxa Naxuum kii reer Elkosh la tusay. 2 Rabbigu
waa Ilaah masayr ah oo waa aarsadaa, Rabbigu waa
aarsadaa oo waa cadho miidhan. Rabbigu cadaawayaashiisa
waa ka aargutaa, oo cadowgiisana cadho buu u kaydiyaa. 3
Rabbigu cadho wuu u gaabiya, waana xoog badan yahay,
oo kii gardaran sinaba eedlaawe ugu haysan maayo.
Rabbigu wuxuu jid ku leeyahay dabaysha cirwareenta ah
iyo duufaanka, oo daruuruhuna waa boodhkii cagihiisa. 4
Isagu wuxuu canaantaa badda, oo weliba iyaduu engejiyaa,
oo webiyaasha oo dhanna wuu wada qallajiyaa. Baashaan
iyo Karmel way engegaan, oo ubixii Lubnaanna waa
dhaday. 5 Buuruhu way ka gariiraan isaga, oo kuruhuna way
dhalaalaan, oo dhulka xataa dunida iyo waxa deggan oo
dhammuba way ku rogmadaan hortiisa. 6 Bal yaa dhirifkiisa
is-hor taagi kara? Oo bal yaa u adkaysan kara kulaylka
cadhadiisa? Cadhadiisu waa u daadatay sidii dab oo kale,
oo dhagaxyada waaweynna isagaa kala dildillaacshay. 7
Rabbigu waa wanaagsan yahay, oo wakhtigii dhib jirona
waa qalcad, wuuna garanayaa kuwa isaga isku halleeya. 8
Laakiinse meesheeda wuxuu ku baabbi'in doonaa daad soo
buuxdhaafay, oo cadaawayaashiisana wuu u eryan doonaa
gudcurka dhexdiisa. 9 War maxaad Rabbiga la damacsan
tihiin? Isagu wuu wada baabbi'in doonaa. Dhibaatana mar
labaad soo ma kici doonto. 10 Waayo, in kastoo ay la mid
yihiin qodxan isku wada murugsan, oo ay yihiin sidii kuwo
cabniinkoodii ku sakhraamay, haddana waxaa loo wada
baabbi'in doonaa sidii bal engegay. 11 Waxaa kaa soo baxay
mid Rabbiga wax shar ah u fikira, oo xumaato ku taliya. 12
Rabbigu wuxuu leeyahay, In kastoo ay xoog badan yihiin
oo weliba ay tiro badan yihiin, haddana iyaga waa la wada
gooyn doonaa, oo isna wuu dhammaan doonaa. In kastoo
aan idin dhibay, mar dambe idin dhibi maayo. 13 Oo haatan
harqoodkiisa waan idinka jebin doonaa, oo jebbooyinka
idinku xidhanna waan jebin doonaa. 14 Oo Rabbigu wuxuu
bixiyey amar kugu saabsan, si aan innaba mar dambe jirin
farcan magacaaga sii wada. Guriga ilaahyadaada waxaan
ka baabbi'in doonaa sanamka xardhan iyo sanamka la
shubay, oo waxaan samayn doonaa qabrigaagii, waayo,
waxaad tahay wax la fududaystay. 15 Bal eega kan warka
wanaagsan keenaya oo nabadda faafinaya cagihiisa oo
buuraha dul socda! Dadka Yahuudahow, iidihiinna dhawra,
oo nidarradiinna oofiya, waayo, kii sharka ahaa mar dambe
idinma soo dhex mari doono, waayo, isagii waa la wada
baabbi'iyey.

2 Kii wax burburinayay waa u soo baxay hortiinna.
Qalcaddiinna dhawra, oo jidka ilaaliya, oo guntiga isku
giijiya, oo xooggiinnana si weyn u adkeeya. 2 Waayo,
Rabbigu sharaftii reer Yacquub wuu u soo celinayaa
sidii sharaftii reer binu Israa'iil oo kale, waayo, kuwii
wax dhici jiray ayaa dhacay, oo laamahoodii canabka
ahaana way wada baabbi'iyeen. 3 Oo raggiisa xoogga
badan gaashaankoodiina waa la caseeyey, oo ragga
dagaalyahanka ahuna waxay xidhaan dhar guduudan,
oo maalintii isdiyaarintiisana gaadhifardoodyadu waa bir
widhwidha, oo warmihiina waa loo ruxay si cabsi badan. 4
Gaadhifardoodyada ayaa jidadka dhexdooda ka gurdamaya,
oo jidadka balballaadhan ayaa midkoodba kan kale ku
cidhiidhinaya, oo muuqashadooduna waa sida qori iftiimaya
oo kale, waxayna u ordayaan sida hillaaca oo kale. 5 Wuxuu
xusuustaa geesiyaashiisii, way turunturoodaan markay
socdaan, oo derbigay ku degdegayaan, gabbaadkana waa
la diyaariyey. 6 Irdihii webiyaashu way furmeen, oo gurigii
boqorkuna waa baabba'ay. 7 Husab waa qaawan tahay,
iyadii waa la kaxaystay, oo addoommaheediina waxay
ugu musannaabayaan cod u eg midka qoolleyda oo kale,
laabtana way garaacayaan. 8 Laakiinse Nineweh waxay
tan iyo waagii hore ahaan jirtay sidii balli biya ah, habase
yeeshee way cararayaan. Waxaa lagu qayliyaa, War jooga,
jooga! laakiinse ninna dib uma eego. 9 War lacagta dhaca,
oo dahabka dhaca, waayo, kaydka iyo maalka wacan oo
sharafta leh oo dhammu innaba dhammaad ma leh. 10 Way
madhan tahay, oo waa baabba', oo waa cidla, oo qalbigu waa
dhalaalayaa, lowyuhuna way isgaraacayaan, oo qof kasta
dhexdiisa xanuun baa ku jira, oo kulligoodna wejigooda cabsi
baa ka muuqanaysa. 11 Bal meeday bohoshii libaaxyadu, oo
meeday meeshii lagu quudin jiray libaaxyada qayrabka ah,
taasoo ah meeshii ay ku socon jireen aarka iyo goosha iyo
dhasha libaaxu, iyagoo aan ciduna cabsiin? 12 Aarkii libaaxu
wuxuu dhashiisii u dildillaaciyey wax ku filan, oo goolihiisiina
wax buu u dilay, oo godadkiisii wuxuu ka buuxsaday ugaadh,
oo boholihiisiina wuxuu ka buuxsaday raq. 13 Rabbigii
ciidammadu wuxuu leeyahay, Bal eega, anigu col baan idinla
ahay, oo gaadhifardoodyadana qiiq baan ku gubi doonaa, oo
libaaxyada qayrabyada ahna seef baa baabbi'in doonta, oo
waxa aad ugaadhsataanna dhulkaan ka dhammayn doonaa,
oo codkii wargeysyadiinnana mar dambe lama maqli doono.

3 Waxaa iska hoogtay magaalada dhiigga! Waayo,
dhammaanteed waxaa ka buuxa been iyo dhac, oo
boobkuna iyada kama dhammaado. 2 Oo waxaa ka
buuxa dhawaaqa karbaashka, iyo dhawaaqa giraangiraha
qablamaya, iyo fardo qoobqaadaya, iyo gaadhifardoodyo

boodboodaya, 3 iyo fardooley hor u socda, iyo seef
dhalaalaysa, iyo waran birbirqaya, iyo dad badan oo la laayay,
iyo bakhti faro badan oo iskor tuulsan, oo meydadkuna
innaba dhammaad ma leh, oo waa lagu turunturoodaan
meydadkooda, 4 maxaa yeelay, waa dhillanimadii faraha
badnayd oo ay fashay dhilladii aad loo jeclaa oo ah sayidaddii
sixirrada, oo quruumo ku iibisa dhillanimadeeda, oo reerona
ku iibisa sixirradeeda. 5 Rabbigii ciidammadu wuxuu leeyahay,
Bal eeg, col baan kula ahay, oo gogaradahaagana waan kaa
feydi doonaa oo wejigaan kuu saari doonaa, oo waxaan
quruumaha tusi doonaa cawradaada, boqortooyooyinkana
ceebtaada. 6 Oo wasakh baan korkaaga ku tuuri doonaa,
oo ceeb baan ku saari doonaa, oo waxaan kaa dhigi
doonaa wax lagu dhaygago. 7 Oo waxay noqon doontaa
in kuwa ku fiiriya oo dhammu ay kaa cararaan oo ay
yidhaahdaan, Nineweh waa la baabbi'iyey, bal yaa iyada u
barooran doona? Xaggee baanse kuwa u tacsiyeeya uga
doonaa? 8 Bal adigu miyaad ka wanaagsan tahay Noo
Aamoon, taasoo webiyada dhexdooda ku jirtay, oo ay biyuhu
ku hareeraysnaayeen, oo dhufayskeedu u badda ahaa,
derbigeeduna u badda ahaa? 9 Itoobiya iyo Masar waxay
ahaayeen xooggeeda aan dhammaadka lahayn, oo reer
Fuud iyo reer Luubiimna waxay ahaayeen kuwii u hiilin jiray.
10 Habase yeeshee iyadii waa la kaxaystay oo maxaabiis
ahaan baa loo watay, oo dhallaankeediina dhulkaa lagaga
tuuray jidadka rukummadooda oo dhan, oo nimankeedii
sharafta lahaa saami baa loo ritay, oo raggeedii waaweynaa
oo dhanna silsilado baa lagu xidhay. 11 Oo weliba adigu
waad sakhraami doontaa oo waad qarsoonaan doontaa,
adiguna cadowga aawadiis dufays baad doondooni doontaa.
12 Qalcadahaaga oo dhammu waxay noqon doonaan sida
geedo berde ah oo midho hore u bislaaday ku yaalliin, oo
haddii la ruxruxo waxay ku soo daatan kan wax cuna afkiisa.
13 Bal eeg, dadkaaga ku dhex jooga waa dumar, oo irdaha
dalkaaguna waa u bannaan yihiin cadaawayaashaada,
oo qataaradaadiina dab baa baabbi'iyey. 14 Biyo u soo
dhaanso hareeraynta aawadeed, oo qalcadahaagana adkee.
Dhoobada dhex gal, oo dhigada ku joogjoogso, oo xoog
u yeel meesha lebenka lagu dubo. 15 Halkaasaa dab
kugu laasan doona, oo seef baa ku baabbi'in doonta, oo
waxay kuu dhammayn doontaa sida koronkorro, bal isu
badi sidii koronkorro oo kale, oo sidii ayax oo kale isu
badi. 16 Baayacmushtariyaashaadii waxaad ka sii badisay
xiddigaha samada, koronkorraduse intay wax cunto bay
iska duushaa. 17 Kuwaaga taajka lahu waa sidii ayax oo
kale, oo karraaniyaashaaduna waa sidii kobojaan raxan ah,
kaasoo maalintii qabow xaydaanka dhex dega, laakiinse
kolkii qorraxdu soo baxdo way iska cararaan, oo meeshay
joogaan lama yaqaan. 18 Boqorkii Ashuurow, adhijirradaadii
lulo baa haysa, geesiyaashaadii way nasanayaan, dadkaagii
wuxuu ku kala firidhsan yahay buuraha dushooda, oo wax
iyaga soo ururiyana lama arko. 19 Nabarkaagu bogsan
maayo, dhaawacaaguna aad buu u xun yahay, oo kuwa
warkaaga maqla oo dhammuba way kugu sacab tumaan,
waayo, bal waa kuma kan aanay xumaantaadu had iyo
goorba gaadhin?

# Xabaquuq

**1** Kanu waa waxa culus ee uu Nebi Xabaquuq arkay. **2**
Rabbiyow, ilaa goormaan kuu qayshadaa, oo adna aadan
i maqlayn? Dulmi baan kaaga qayshadaa, oo namana aad
badbaadisid. **3** Bal maxaad xumaan ii tustaa oo aad qallooc
iigu jeedisaa? Waayo, waxaa hortayda yaal halligaad iyo
dulmi, oo waxaa kor u kaca dirir iyo dagaal. **4** Sidaas
daraaddeed sharcigii waa dabcay oo caddaaladduna hore
uma socoto, waayo, kii sharrow ah ayaa hareereeya kii xaq
ah, oo sidaas daraaddeed garsooridda waa la qallooc iyaa. **5**
Bal eega quruumaha dhexdooda, ka fiirsada oo aad u yaaba,
waayo, maalmihiinnii waxaan samaynayaa shuqul aydaan
rumaysan doonin in kastoo laydiin sheego. **6** Waayo, bal
eega, waxaan soo kicinayaa reer Kaldayiin oo ah quruuntaas
qadhaadh oo degdegga badan oo dhulka ballaadhkiisa mara
inay hantiyaan meelo la dego oo ayan iyagu lahayn. **7** Iyagu
waa kuwa laga cabsado oo aad looga baqo; xukunkooda
iyo sharaftoodu iyagay ka soo baxaan. **8** Fardahoodu way
ka sii dheereeyaan shabeelka, oo way ka sii cabsi badan
yihiin yeyda fiidka, oo fardooleydooduna way iskala bixiyaan,
haah, oo fardooleydooduna meel fog bay ka yimaadaan,
oo waxay u soo duulaan sida gorgor u soo degdegaya
inuu wax dhufsado oo cuno. **9** Dhammaantood waxay u
yimaadaan inay wax xoogaan, oo damaca wejigooduna waa
sida dabaysha bari, oo waxay urursadaan maxaabiis sida
cammuudda u badan. **10** Cadowgu boqorro wuu quudhsadaa,
oo amiirrona wuu fududaystaa, oo qalcad kastana wuu
ku qoslaa, waayo, intuu ciid tuulaa ayuu iska qabsadaa.
**11** Markaas sida dabayl buu u dhaafi doonaa, oo wuu sii
gudbi doonaa, oo dembi buu lahaan doonaa kan xooggiisu
ilaah u yahay. **12** Rabbiyow, Ilaahaygiiyow, kayga Quduuska
ahow, sow adigu weligaaba ma aad jiri jirin? Annagu dhiman
mayno. Rabbiyow, isaga waxaad u diyaarisay xukun, oo
waxaad u xoogaysay edbin, kaaga Dhagaxa weyn ahow. **13**
Waxaad tahay mid indhihiisu ka sii daahirsan yihiin inay wax
shar ah eegaan, oo qalloocna ma fiirin kartid, haddaba bal
maxaad u fiirisaa kuwa khiyaanada sameeya? Oo maxaad u
aamusan tahay marka sharrowgu liqo ninka isaga ka sii xaq
yahay? **14** Oo maxaad dadka uga dhigtaa sida kalluunka
badda, iyo sida waxa gurguurta oo aan lahayn mid iyaga u
taliya? **15** Isagu dhammaantood ayuu jillaab ku soo qaataa,
oo shabaggiisuu ku soo qabsadaa, oo intuu shabaggiisa
ku soo wada urursado ayuu soo jiitaa, haddaba sidaas
daraaddeed wuu reyreeyaa oo farxaa. **16** Haddaba sidaas
daraaddeed allabari buu u bixiyaa shabaggiisa, oo fooxna
wuu u shidaa shabagguu jiita, maxaa yeelay, iyaga ayaa
qaybtiisii ku barwaaqowday, oo quudkiisiina aad iyo aad
batay. **17** Haddaba miyuu shabaggiisa madhin doonaa, oo
miyuu quruumaha had iyo goorba layn doonaa, isagoo aan
u tudhin?

**2** Meeshayda aan wax ka dhawro ayaan istaagi doonaa,
qalcaddana waan isa saari doonaa, waanan u fiirin
doonaa bal waxa uu igula hadli doono, iyo waxa aan
uga jawaabi doono cabashadayda. **2** Oo Rabbigu wuu ii
jawaabay, oo wuxuu igu yidhi, Waxa lagu tusay qor, oo
looxyo ku caddee, si kii akhristaaba u ordo. **3** Waayo, wixii
lagu tusay waa weli, oo waxay iman doonaan wakhtigii la
yidhi, wayna u degdegaan ugudambaysta, oo innaba been
ma sheegi doonaan. In kastoo ay raagaan waa inaad sugtaa,
maxaa yeelay, sida xaqiiqada ah way noqon doonaan,
oo innaba ma raagi doonaan. **4** Bal eega, kan madaxa
weynaaday naftiisii way kibirtay, oo ma toosna, laakiinse kii
xaq ahu rumaysadkiisa buu ku noolaan doonaa. **5** Haah,
oo weliba khamrigu wax buu khiyaanaa, oo nin isla weynu
gurigiisa kuma xasillo. Wuxuu xiisihiisa u ballaadhiyaa sida
She'ool oo kale, oo isagu waa sida geerida oo kale oo
innaba lama dherjin karo, laakiinse wuxuu soo urursadaa
quruumaha oo dhan, oo wuxuu isu geeystaa dadyowga oo
dhan. **(Sheol h7585)** **6** Kuwan oo dhammu sow isaga kuma
halqabsan doonaan? Oo sow maahmaahyo kuma quudhsan
doonaan? Waxay odhan doonaan, Waxaa iska hoogay
kan urursada wax uusan isagu lahayn! Bal ilaa goorma?
Waxaa iska hoogay kan rahaamado isku rara! **7** Kuwii ku
qaniini lahaa sow haddiiba ma kici doonaan? Oo kuwii ku
dhibi lahaa sow ma toosi doonaan? Oo adna booli baad
iyaga u noqon doontaa. **8** Quruumo badan baad dhacday,
haddaba sidaas daraaddeed dadyowga intooda hadhay oo
dhammu aday ku dhici doonaan, taasuna waa dhiiggii dadka
daraaddiis, iyo dulmigii lagu sameeyey dalka iyo magaalada
iyo inta dhex deggan oo dhanba. **9** Waxaa iska hoogay kii
faa'iido shar ah reerkiisa u soo urursada si uu buulkiisa uga
dhisto meel sare oo uu gacanta sharka uga samatabbaxo!
**10** Dadyowga badan oo aad baabbi'isay daraaddood waxaad
reerkaagii ugu arrimisay ceeb, oo waxaad ku dembaabtay
naftaadii. **11** Waayo, dhagax baa ka qaylin doona derbiga
dhexdiisa, oo loox alwaaxda ku dhex jira ayaa u jawaabi
doona. **12** Waxaa iska hoogay kii magaalo dhiig ku dhisa, oo
magaalo xumaan ku adkeeya! **13** Bal eeg in dadku ay dabka
aawadiis u hawshoodaan, oo quruumuhuna ay waxtarla'aan
isu daaliyaan sow ma aha mid Rabbiga ciidammada xaggiisa
ka timid? **14** Waayo, sida biyuhu badda u daboolaan oo kale
ayaa dhulka waxaa ka buuxsami doona aqoonta sharafta

Rabbiga. 15 Waxaa iska hoogay kaaga deriskiisa khamri
cabsiiya, oo cadho ugu shuba, oo weliba u sakhraamiya si uu
cawradooda u fiirsada aawadeed! 16 Adigu intaad sharaf heli
lahayd waxaa ka buuxsantay ceeb, oo weliba adiguna khamri
cab, oo waxaad noqotaa sida mid buuryaqab ah. Rabbiga
gacantiisa midig koobka ku jira adiguu kugu soo rogman
doonaa, oo sharaftaadana waxaa ku dhici doonta ceeb
xun. 17 Waayo, waxaa ku dabooli doona dulmigii Lubnaan
lagu sameeyey, iyo halligaaddii ku dhacday xayawaankii
iyaga ka cabsiiyey, taasuna waa dhiiggii dadka daraaddiis,
iyo dulmigii lagu sameeyey dalka iyo magaalada iyo inta
dhex deggan oo dhanba. 18 Bal muxuu taraa sanamka
xardhan, oo muxuu kii sameeyey u xardhay? Oo muxuu
taraa sanamka la shubay oo ah macallinka beenta bara, oo
kii sameeyey muxuu haddana isugu halleeyaa, waayo, waa
sanamyo carrab la'. 19 Waxaa iska hoogay kii qoriga ku
yidhaahda, Toos! oo dhagax carrab la' ku yidhaahda, Sara
joogso! Kanu miyuu wax bari doonaa? Bal eega, waxaa
lagu dahaadhay dahab iyo lacag, laakiinse innaba neefu
kuma jirto. 20 Laakiinse Rabbigu waa ku jiraa macbudkiisa
quduuska ah, haddaba inta dhulka joogta oo dhammu ha ku
hor aamuseen.

# 3

Tanu waa salaaddii Xabaquuq, oo lagu luuqeeyo
Shigyonood. 2 Rabbiyow, waxaan maqlay warkaagii,
waanan cabsanayaa. Rabbiyow, shuqulkaaga soo noolee
sannadaha dhexdooda, Sannadaha dhexdooda ogeysii, Oo
markii aad cadhootid naxariis soo xusuuso. 3 Ilaah wuxuu ka
yimid Teemaan, Kii Quduuska ahaana wuxuu ka yimid Buur
Faaraan. (Selaah) Sharaftiisii waxay ku fidday samooyinka,
Oo dhulkiina waxaa ka buuxsamay ammaantiisii. 4 Oo
dhalaalkiisiina wuxuu ahaa sida nuurka, Wuxuuna lahaa
iftiin gacantiisa ka soo baxaya. Oo waxaa halkaas ku
qarsoonaa xooggiisa. 5 Waxaa hortiisa socday belaayo, Oo
waxaa daba socday xummad. 6 Wuu istaagay, oo dhulkuu
qiyaasay, Wax buu fiiriyey, oo quruumihii buu kala eryay.
Kolkaasaa buurihii weligood ahaa kala firdheen, Oo kurihii
daa'imiska ahaana way wada foororsadeen. Socodkiisuna
wuxuu ahaa sidii waagii hore. 7 Waxaan arkay teendhooyinkii
reer Kushan oo dhib ku dhex jira. Daahyadii dalka reer
Midyaanna way gariireen. 8 Rabbigu ma wuxuu u cadhooday
webiyaasha? Ma waxaad u xanaaqday webiyaasha Mase
waxaad u cadhootay badda? Ma saas aawadeed baad
u soo fuushay fardahaaga, Iyo gaadhifardoodyadaadii
badbaadinta? 9 Qaansadaadii daaha baad ka qaadday,
Dhaartii aad qabiilooyinka ugu dhaaratayna waxay ahayd
eray run ah. (Selaah) Dhulka waxaad ka dillaacisay webiyaal.
10 Buurihii way ku arkeen, oo way cabsadeen. Biyaha xoogga
lahuna way iska gudbeen, Moolkii codkiisuu ku hadlay,
Gacmihiisiina kor buu u taagay. 11 Qorraxdii iyo dayaxiiba
waxay istaageen rugtoodii, Markay fallaadhahaaga nuuraya
lalayeen, Iyo markuu warankaaga dhalaalaya birbirqay. 12
Dalkii xanaaq baad kula dhex socotay, Quruumihiina cadho
baad ku tuntay. 13 Waad u soo baxday inaad dadkaaga
badbaadiso daraaddeed, Iyo inaad badbaadiso kaaga
subkan. Reerka sharrowga madaxiisa waad dhaawacday.
Aasaaskiina waad soo bandhigtay. (Selaah) 14 Madaxii
dagaalyahanyadiisa waxaad ku mudday ulihiisii, Waxay u
yimaadeen sidii dabayl cirwareen ah inay i kala firdhiyaan
daraaddeed. Rayrayntoodu waxay ahayd inay masaakiinta
qarsoodi u dhammeeyaan. 15 Fardahaagii waad kula tumatay
baddii, Taasoo ahayd biyaha aad u badan oo iskor taallaysan.
16 Anigu waan maqlay, kolkaasaan caloosha ka naxay,
Oo codkii aawadiis ayaa bushimahaygu la qadhqadheen,
Lafahaygiina way qudhmeen, oo meeshaydaan ku gariiray,
Inaan iska nasto intaan sugayo maalinta dhibka Oo ay
ciidammadu ku soo kici doonaan dadka. 17 Waayo, in kastoo
berduhu uusan ubxin, Ama aan midho ku oollin geedaha
canabka ah, Oo hawsha saytuunka lagu khasaaro, Ama
aan beeraha quud ka bixin, Oo adhigu xerada ka baabbo'o,
Oo golahana aan xoolo lagu arag, 18 Haddana Rabbiga
waan ku rayrayn doonaa, Oo Ilaaha badbaadadayda ah
waan ku farxi doonaa. 19 Rabbiga Sayidka ah ayaa xoog ii
ah, Cagahaygana wuxuu ka dhigaa sida cagaha deerada,
Oo wuxuu igu socodsiin doonaa meelahayga sarsare. Tan
waxaa lagu tiriyey madaxdii muusikaystayaasha, oo waxaa
lagu qaadaa alaabtayda xadhkaha leh.

# Sefanyaah

**1** Kanu waa Eraygii Rabbiga oo u yimid Sefanyaah ina
Kuushii, ina Gedalyaah, ina Amaryaah, ina Xisqiyaah,
wakhtigii Yoosiyaah ina Aamoon uu boqorka ka ahaa dalka
Yahuudah. 2 Rabbigu wuxuu leeyahay, Anigu wax kasta
waan ka baabbi'in doonaa dhulka korkiisa. 3 Rabbigu
wuxuu leeyahay, Dad iyo duunyoba waan wada baabbi'in
doonaa, haadda samada iyo kalluunka baddaba waan
wada baabbi'in doonaa, oo waxa lagu turunturoodo iyo
sharrowyadaba waan wada baabbi'in doonaa, oo binu-
aadmigana waan ka gooyn doonaa dhulka korkiisa. 4 Oo
gacantaydaan ku soo kor fidin doonaa dalka Yahuudah
iyo inta Yeruusaalem deggan oo dhan, oo intii Bacal ka
hadhayna meeshan waan ka gooyn doonaa, iyo magaca
Kemaariim iyo wadaaddada, 5 iyo kuwa ciidanka samada ku
caabuda guryaha dhaladooda, iyo kuwa Rabbiga caabuda
oo ku dhaarta oo haddana ku dhaarta Malkaam, 6 iyo
kuwa dib uga noqday Rabbiga lasocodkiisii, iyo kuwa aan
Rabbiga doondoonin ama aan isaga innaba wax ka baryin.
7 Sayidka Rabbiga ah hortiisa ku aamus, maxaa yeelay,
maalintii Rabbigu waa soo dhow dahay, waayo, Rabbigu waa
diyaariyey allabari, oo martidiisiina quduus buu ka dhigay. 8
Oo maalinta Rabbiga allabarigiisa ayaan ciqaabi doonaa
amiirrada iyo wiilasha boqorka, iyo inta dharka qalaad xidhan
oo dhanba. 9 Maalintaas waxaan wada ciqaabi doonaa kuwa
marinka ka booda, oo guriga sayidkooda ka buuxiya dulmi iyo
khiyaano. 10 Oo Rabbigu wuxuu leeyahay, Isla maalintaas
qaylo dhawaaqeed ayaa ka yeedhi doona Iridda Kalluunka,
oo magaalada inteeda labaadna waxaa ka yeedhi doonta
baroor, kurahana waxaa ka yeedhi doona daryaan weyn. 11
Kuwiinna Makteesh degganow, qayliya, waayo, dadkii reer
Kancaan oo dhammu waa dhammaaday, oo kuwii lacagta
ku rarnaa oo dhammu waa baabba'. 12 Oo wakhtigaas
ayaan Yeruusaalem laambado ku baadhi doonaa, waanan
ciqaabi doonaa dadka gufarkooda isaga fadhiyey sida khamri
deggan oo kale, oo qalbigooda iska yidhaahda, Rabbigu
wax wanaagsan samayn maayo, wax shar ahna samayn
maayo. 13 Maalkoodu wuxuu noqon doonaa wax la boobo,
guryahooduna waxay noqon doonaan meel baabba' ah,
haah, oo waxay dhisan doonaan guryo, laakiinse ma ay
degi doonaan, oo waxay beeran doonaan beero canab ah,
laakiinse khamrigooda ma ay cabbi doonaan. 14 Maalintii
weynayd oo Rabbigu way soo dhow dahay, way soo dhow
dahay, oo aad bay u soo degdegaysaa. Dhawaaqi maalinta
Rabbigu mar dhow buu yeedhi doonaa, dadka xoogga
badanuna halkaasay si qadhaadh ah uga qaylin doonaan.
15 Maalintaasu waa maalin ay cadho jirto, oo waa maalin ay
jiraan dhibaato iyo cidhiidhi, oo waa maalin ay jiraan dumin
iyo baabbi'in, oo waa maalin ay jiraan gudcur iyo mugdi
madow, oo waa maalin ay jiraan daruuro iyo gudcur dam ah,
16 oo waa maalin ay jiraan buun iyo qaylo dagaaleed oo
ka gees ah magaalooyinka deyrka leh, iyo munaaradaha
dhaadheer. 17 Dadka waxaan ku soo dejin doonaa cidhiidhi
inay u socdaan sidii dad indha la', maxaa yeelay, Rabbigay
ku dembaabeen, oo dhiiggoodu wuxuu u daadan doonaa
sida boodh oo kale, hilibkooduna sida digo oo kale. 18
Oo maalinta cadhada Rabbiga lacagtooda iyo dahabkooda
midna kama samatabbixin doono iyaga, laakiinse dalka oo
dhan waxaa baabbi'in doona dabka qiiradiisa, oo dhulka waxa
deggan oo dhanna haddiiba dhaqsiyuu u wada dhammayn
doonaa.

**2** Isa soo urursada, quruuntan aan xishoodka lahaynay, isa
soo urursada, 2 intaan amarku soo bixin, oo aan maalintu
u dhaafin sida xaab oo kale, intaan Rabbiga xanaaqiisa kululu
idinku soo degin, intaan maalinta cadhada Rabbigu idinku
soo degin. 3 Rabbiga doondoona, dhammaantiin kuwiinna
camalka qabow ee dhulkow, oo xukunkiisa yeelayow,
xaqnimo doondoona, oo qabownaan doondoona. Waxaa
laga yaabaa inaad maalinta cadhada Rabbiga qarsoonaan
doontaan. 4 Waayo, Gaasa waa la dayrin doonaa, oo
Ashqeloonna waxay noqon doontaa meel cidla ah, oo dadka
Ashdoodna waxaa la eryi doonaa hadh cad, Ceqroonna
waa la rujin doonaa. 5 Waxaa iska hoogay dadka deggan
badda xeebteeda, waana quruunta reer Kereetiim! Kancaan
oo ah dalka reer Falastiinow, Rabbiga eraygiisu waa kaa
gees. Waan ku baabbi'in doonaa si aan qof keliyuhuna kuu
sii degganaan. 6 Badda xeebteedu waxay noqon doontaa
berrimmo daaqsiin ah, oo leh rug adhijirro iyo xeryo adhi. 7
Oo xeebta waxaa yeelan doona kuwa dadka Yahuudah ka
hadhay. Iyana adhyahooda ayay halkaas daaqsan doonaan,
oo fiidkiina waxay jiifsan doonaan guryihii reer Ashqeloon,
waayo, Ilaaha Rabbigooda ah ayaa iyaga soo booqan doona,
oo maxaabiistoodiina wuu soo celin doonaa. 8 Anigu waan
maqlay caydii reer Moo'aab iyo canaantii reer Cammoon
oo ay dadkayga ku caayeen, iyo inay iska sii weyneeyeen
soohdintooda. 9 Sidaas daraaddeed Rabbiga ciidammada oo
ah Ilaaha reer binu Israa'iil wuxuu leeyahay, Noloshaydaan
ku dhaartay oo sida xaqiiqada ah Moo'aab waxay noqon
doontaa sida Sodom oo kale, oo reer Cammoonna waxay
noqon doonaan sida Gomora oo kale, oo waxay ahaan
doonaan meel maraboob ka baxo, iyo godad cusbo, iyo meel
had iyo goor cidla ah. Kuwa dadkayga ka hadhay ayaa dhici

doona oo inta quruuntayda ka hadhay ayaa dhaxli doonta.
10 Kibirkoodii aawadiis ayay waxan u heli doonaan, maxaa
yeelay, waxay caayeen oo iska weynaysiiyeen dadkii Rabbiga
ciidammada. 11 Rabbigu wuxuu iyaga u noqon doonaa
mid aad looga cabsado, waayo, wuu wada macaluulin
doonaa ilaahyada dhulka oo dhan, kolkaasay dadku isaga
caabudi doonaan, oo mid kastaaba wuxuu isaga ka caabudi
doonaa meeshiisa, oo xataa quruumaha gasiiraduhu way
wada caabudi doonaan isaga. 12 Oo weliba reer Itoobiyow,
idinkana waxaa laydinku layn doonaa seeftayda. 13 Oo
isagu gacantiisuu u fidin doonaa xagga woqooyi, oo dalka
Ashuur wuu wada baabbi'in doonaa, oo Ninewehna cidla
buu ka dhigi doonaa iyo lamadegaan engegan. 14 Oo
waxaa dhexdeeda jiifsan doona xoolo iyo xayawaanka
quruumaha oo dhan, oo cantalyaaga iyo caanaqubtuba
waxay ku dhex hoyan doonaan tiirarkeeda. Cod baa ka
gabyi doona daaqadaheeda, oo waxaa marinnada joogi
doona abaar, waayo, isagu wuu soo bandhigay shuqulkii
qoriga kedarka ah laga qabtay. 15 Tanu waa magaaladii
faraxa badnayd oo feyigla'aanta ku degganayd, oo qalbiga
iska tidhi, Anigaa ah, oo aniga mooyaane mid kale ma jirto.
Waxay noqotay cidla iyo meel dugaag ku hoydo! Mid kasta
oo agteeda soo maraaba wuu ku foodhyi doonaa oo gacanta
quudhsasho la ruxi doonaa.

3 Waxaa iska hoogtay magaalada caasiyowday oo
nijaasowday oo wax dulunta! 2 Iyadu codkii ma ay
addeecin, oo edbintiina ma ay aqbalin, oo Rabbiga iskuma ay
hallayn, oo Ilaahna kuma ay soo dhowaan. 3 Amiirradeeda
iyada dhex jooga waa sida libaaxyo ciyaya, xaakinnadeeduna
waa sida yeey habeennimo oo aan waxba tan iyo aroortii
reebin. 4 Nebiyadeedu waa kuwo fudud oo khiyaano
badan, oo wadaaddadeediina meeshii quduuska ahayd
ayay nijaaseeyeen, oo sharcigiina si xun bay u dhaafeen.
5 Rabbiga dhexdeeda jooga waa xaq, oo innaba xumaan
ma samayn doono, oo caddaaladdiisana aroor kastaba
wuu soo saaraa, oo marnaba kama baaqdo, laakiinse
caddaaladlaawuhu isma ceebsan yaqaan. 6 Anigu quruumo
ayaan baabbi'iyey, oo qalcadahoodiina waa baabba', oo
jidadkoodiina cidla baan ka dhigay si aan ciduna u marin,
oo magaalooyinkoodiina waa la dumiyey, si aan qofna u
joogin oo aan cid keliyuhuna u degganaan. 7 Waxaan idhi,
Sida xaqiiqada ah waad iga cabsan doontaa, oo edbin baad
aqbali doontaa. Markaas hoygeedu uma uu baabbe'een
sidii aan iyada u goostay. Laakiinse aroor horay keceen oo
falimahoodii oo dhan way xumeeyeen. 8 Haddaba i suga,
ayaa Rabbigu leeyahay, ilaa maalinta aan ugaadhsade u soo
kici doono, waayo, waxaan ku talajiraa inaan quruumaha isu
soo ururiyo oo aan boqortooyooyinka isu soo shiriyo, si aan
korkooda ugu shubo dhirifkayga iyo xataa xanaaqayga kulul
oo dhan, waayo, dhulka oo dhan waxaa baabbi'in doona
dabka qiiradayda. 9 Waayo, markaas ayaan dadyowga siin
doonaa af daahir ah, si ay kulligood magaca Rabbiga ugu
yeedhaan, oo ay isaga ugu adeegaan isku niyad keliya. 10
Kuwa i barya oo ah dadkayga firidhsan waxay webiyaasha
Itoobiya shishadooda ka keeni doonaan qurbaankayga. 11
Wakhtigaas uma aad ceeboobi doontid falimahaaga oo
dhan, kuwaas oo aad igaga xadgudubtay, waayo, markaas
waxaan dhexdaada ka bixin doonaa kuwaaga kibray oo
isfaaninaya, oo adna mar dambe ku madax weynaan maysid
buurtayda quduuska ah. 12 Laakiinse dhexdaada waxaan
uga tegi doonaa dad dhibaataysan oo masaakiin ah, oo
iyana magaca Rabbiga ayay isku hallayn doonaan. 13 Kuwa
reer binu Israa'iil ka hadhay xumaan ma samayn doonaan,
beenna ma sheegi doonaan, oo afkoodana innaba carrab
khiyaano badan lagama heli doono, waayo, iyagu wax bay
quudan doonaan oo way iska jiifsan doonaan, oo waxba
iyaga ma cabsiin doonaan. 14 Magaalada Siyoonay, gabay,
reer binu Israa'iilow, qayliya, Magaalada Yeruusaalemay,
farax oo qalbiga oo dhan ku reyree. 15 Rabbigu wuxuu
qaaday xukummadaadii, oo cadowgaagiina wuu tuuray.
Boqorkii reer binu Israa'iil oo Rabbiga ah ayaa dhexdaada
jooga, oo mar dambe shar ka baqi maysid. 16 Wakhtigaas
waxaa Yeruusaalem lagu odhan doonaa, Ha cabsan,
Siyoonay, yaan gacmahaagu debcin. 17 Rabbiga Ilaahaaga
ah ayaa dhexdaada jooga, isagu waa mid xoog badan oo ku
badbaadin doona. Farxad buu kuugu rayrayn doonaa, oo
wuxuu ku nasan doonaa jacaylkiisa, oo gabay buu kuugu
farxi doonaa. 18 Waxaan soo ururin doonaa kuwaagii laga
masaafuriyey oo haatan u murugaysan shirka quduuska ah,
kuwaasoo culaabta kor saaranu ay cay ahayd. 19 Bal eeg,
wakhtigaas anigaa la macaamiloon doona kuwa ku dhiba oo
dhan, oo waan badbaadin doonaa kuwa dhutiya, oo kuwii
la eryayna waan soo ururin doonaa, oo kuwii ceebtoodu
ay wada gaadhay dhulka oo dhan ayaan u yeeli doonaa
ammaan iyo magac. 20 Oo wakhtigaas waan idin soo gelin
doonaa gudaha, oo wakhtigaas waan idin soo ururin doonaa,
waayo, dadyowga dunida jooga oo dhan waxaan idiinku dhex
yeeli doonaa magac iyo ammaan, markaan maxaabiistiinnii
oo dhan hortiinna ku soo celiyo, ayaa Rabbigu leeyahay.

# Xaggay

1 Boqor Daariyus sannaddiisii labaad, bisheedii lixaad,
maalinteedii kowaad ayaa eraygii Rabbigu u yimid
Nebi Xaggay, oo waxaa loogu soo dhiibay Serubaabel ina
Salaatii'eel oo ahaa taliyihii dalka Yahuudah, iyo Yashuuca
ina Yehoosaadaaq oo ahaa wadaadka sare, oo wuxuu ku
yidhi, 2 Rabbiga ciidammadu sidanuu u hadlaa oo wuxuu
leeyahay, Dadkanu waxay yidhaahdaan, Wakhtigii weli lama
gaadhin, wakhtigii guriga Rabbiga la dhisi lahaa weli lama
gaadhin. 3 Markaasaa eraygii Rabbigu u yimid Nebi Xaggay
oo wuxuu yidhi, 4 Ma idiin tahay wakhti aad ku hoyataan
guryihiinna saqafka loo yeelay, iyadoo guriganu uu dunsan
yahay? 5 Haddaba Rabbiga ciidammadu wuxuu leeyahay,
Jidadkiinna ka fiirsada. 6 Wax badan baad beerateen,
laakiinse in yar baad soo gurateen, wax baad cuntaan,
laakiinse innaba kama dheregtaan, wax baad cabtaan,
laakiinse innaba kama wabaxdaan, dhar baad xidhataan,
laakiinse innaba ma diirsataan, oo kii mushahaaro soo
qaataana wuxuu mushahaarada u soo qaata inuu kiish
daloolan ku rito. 7 Haddaba Rabbiga ciidammadu wuxuu
leeyahay, Jidadkiinna ka fiirsada. 8 Rabbigu wuxuu leeyahay,
Buurta fuula, oo alwaax ka keena, oo guriga dhisa, oo anna
waan ku farxi doonaa, oo kolkaasaan ammaanmi doonaa. 9
Rabbiga ciidammadu wuxuu leeyahay, Waxaad filanayseen
wax badan, laakiinse waxay noqdeen in yar, oo markaad
intaas gurigii keenteenna anigu waan afuufay. Waa maxay
sababtu? Maxaa yeelay, gurigaygii baa dunsan oo idinkana
midkiin kastaaba wuxuu u ordaa gurigiisa. 10 Haddaba idinka
daraaddiin ayaa samadii u diidday sayaxeedii oo dhulkiina
wuu diiday midhihiisii. 11 Oo anigu abaar baan u yeedhay, oo
waxaan ku soo dejiyey dhulka, iyo buuraha, iyo hadhuudhka,
iyo khamriga, iyo saliidda, iyo waxaa dhulka ka soo baxa,
iyo dadka, iyo duunyada, iyo hawsha gacmaha oo dhan. 12
Markaasaa Serubaabel ina Salaatii'eel, iyo wadaadkii sare oo
ahaa Yashuuca ina Yehoosaadaaq, iyo dadka intiisii hadhay
oo dhammu waxay addeeceen codkii Rabbiga Ilaahooda ah,
iyo erayadii Nebi Xaggay, waayo, Rabbiga Ilaahooda ah
ayaa isaga soo diray, oo dadkiina Rabbiga hortiisa ayaa
cabsi ku gashay. 13 Markaasaa Xaggay oo ahaa wargeeyihii
Rabbiga dadkii u sheegay farriintii Rabbiga, oo wuxuu ku
yidhi, Rabbigu wuxuu leeyahay, Anigu waan idinla joogaa. 14
Kolkaasaa Rabbigu kiciyey ruuxii Serubaabel ina Salaatii'eel
oo ahaa taliyihii dalka Yahuudah, iyo ruuxii Yashuuca ina
Yehoosaadaaq oo ahaa wadaadka sare, iyo ruuxii dadka
intiisa hadhay oo dhanba, oo intay yimaadeen ayay ka
shaqeeyeen gurigii Rabbiga ciidammada oo Ilaahooda ah,
15 oo taasuna waxay dhacday Boqor Daariyus sannaddiisii
labaad, bishii lixaad, maalinteedii afar iyo labaatanaad.

2 Oo haddana bishii toddobaad maalinteedii kow iyo
labaatanaad ayaa eraygii Rabbigu u yimid Nebi Xaggay,
oo wuxuu yidhi, 2 Hadda waxaad la hadashaa Serubaabel
ina Salaatii'eel oo ah taliyaha dalka Yahuudah, iyo Yashuuca
ina Yehoosaadaaq oo ah wadaadka sare, iyo dadka intiisa
hadhayba, oo waxaad ku tidhaahdaa, 3 Yaa hadhay
oo idin dhex jooga oo gurigan ammaantiisii hore arkay?
Haatanse sidee buu idiinla eg yahay? Sow meel aan waxba
ahayn idiinlama eka? 4 Haddaba Rabbigu wuxuu leeyahay,
Serubaabelow, xoog yeelo. Yashuuca ina Yehoosaadaaq oo
wadaadka sare ahow, xoog yeelo. Dadkiinna dalka jooga
oo dhammow, xoog yeesha oo shaqeeya, waayo, Rabbiga
ciidammadu wuxuu leeyahay, Anigu waan idinla joogaa, 5
sidaan idiin ballanqaaday waagii aad Masar ka soo baxdeen,
oo ruuxaygiina wuu idin dhex joogaa, haddaba ha cabsanina.
6 Waayo, Rabbiga ciidammadu wuxuu leeyahay, Weli wakhti
yar oo gaaban baa ii hadhay, oo dabadeedna waxaan gariirin
doonaa samooyinka, iyo dhulka, iyo badda, iyo berrigaba. 7
Oo quruumaha oo dhanna waan gariirin doonaa, oo waxa ay
quruumaha oo dhammu jeclaystaan way iman doonaan,
oo anna gurigan waxaan ka buuxin doonaa ammaan, ayaa
Rabbiga ciidammadu leeyahay. 8 Rabbiga ciidammadu
wuxuu leeyahay, Lacagta anigaa leh, oo dahabkana anigaa
leh. 9 Rabbiga ciidammadu wuxuu leeyahay, Ammaanta
gurigan dambe waa ka sii weynaan doontaa tan kii
hore. Oo Rabbiga ciidammadu wuxuu leeyahay, Meeshan
dhexdeeda ayaan nabad ku siin doonaa. 10 Boqor Daariyus
sannaddiisii labaad, bisheedii sagaalaad, maalinteedii afar
iyo labaatanaad ayaa eraygii Rabbigu u yimid Nebi Xaggay,
oo wuxuu ku yidhi, 11 Rabbiga ciidammadu wuxuu leeyahay,
Haddaba wadaaddada waxaad weyddiisaan wax sharciga ku
saabsan, oo waxaad ku tidhaahdaan, 12 Haddii mid darafka
maradiisa ku qaato hilib quduusan, oo uu darafkiisu taabto
kibis, ama fuud, ama khamri, ama saliid, ama wax kale oo
cunta ah, miyey waxaasu quduus noqonayaan? Kolkaasaa
wadaaddadii waxay ugu jawaabeen oo ku yidhaahdeen.
Maya. 13 Kolkaasaa Xaggay yidhi, Haddii mid ku nijaasoobo
meyd oo uu taabto wax kuwan ka mid ah, miyaa kaasuu
nijaasoobayaa? Oo wadaaddadiina waxay ugu jawaabeen
oo ku yidhaahdeen, Wuu nijaasoobayaa. 14 Markaasaa
Xaggay jawaabay oo wuxuu yidhi, Rabbigu wuxuu leeyahay,
Dadkanu waa saasoo kale, oo quruuntanuna saasoo kalay
hortayda ku tahay, oo shuqul kasta oo ay gacmahooda
ku qabtaanna waa saasoo kale, oo wixii ay halkaas ku

bixiyaanna waa nijaas. 15 Haddaba waan idin baryayaaye,
maanta intii ka bilaabata iyo wixii ka dambeeyaba ka fiirsada
intaan dhagaxna dhagax la dul saarin macbudka Rabbiga,
16 iyo tan iyo wakhtigaas oo dhan markii la doonto tulmo
ah labaatan, waxaa laga helay toban keliya, oo markii loo
yimaado in macsarada khamriga laga soo dhaansado konton
weel, waxaa ku jiray labaatan weel oo keliya. 17 Anigu
shuqulka gacmihiinna oo dhan waxaan ku dhuftay beera-
engeeg iyo cariyaysi iyo roobdhagaxyaale, laakiinse iima
aydaan soo noqon ayaa Rabbigu leeyahay. 18 Haddaba
waan idin baryayaaye maanta intii ka bilaabata iyo wixii ka
dambeeyaba ka fiirsada, oo bishii sagaalaad maalinteedii
afar iyo labaatanaad oo ahayd maalintii la dhigay aasaaska
macbudka Rabbiga, aad uga fiirsada. 19 Maqsinka iniino ma
ku jiraan? Hubaal canabka iyo berdaha iyo rummaanka iyo
saytuunka midkoodna midho ma dhalin, laakiinse maanta
inta ka bilaabata waan idin barakayn doonaa. 20 Markaasaa
mar labaad eraygii Rabbigu u yimid Nebi Xaggay, taasuna
waxay ahayd bisha maalinteedii afar iyo labaatanaad, oo
wuxuu ku yidhi, 21 La hadal Serubaabel oo ah taliyaha
dalka Yahuudah, oo waxaad ku tidhaahdaa, Waxaan gariirin
doonaa samooyinka iyo dhulkaba, 22 waanan afgembiyi
doonaa carshiga boqortooyooyinka, oo waan baabbi'in
doonaa xoogga boqortooyooyinka quruumaha, waanan
afgembiyi doonaa gaadhifardoodyada iyo kuwa fuushanba,
oo fardaha iyo kuwa ku joogaaba way dhici doonaan, oo
mid kastaaba wuxuu ku dhiman doonaa seefta walaalkiis.
23 Rabbiga ciidammadu wuxuu leeyahay, Serubaabelow,
Addoonkaygiiyow, ina Salaatii'eelow, maalintaas waan ku
qaadan doonaa, ayaa Rabbigu leeyahay, oo waxaan kaa dhigi
doonaa sidii shaabad oo kale, waayo, Rabbiga ciidammadu
wuxuu leeyahay, Anigu waan ku doortay.

# Sekaryaah

**1** Boqor Daariyus sannaddiisii labaad, bishii siddeedaad
ayaa eraygii Rabbigu u yimid Sekaryaah oo ahaa ina
Berekyaah ina Iddo oo nebigii ahaa, oo wuxuu ku yidhi,
**2** Rabbigu aad buu awowayaashiin ugu cadhooday. **3**
Haddaba sidaas daraaddeed waxaad iyaga ku tidhaahdaa,
Rabbiga ciidammadu wuxuu leeyahay, Ii soo noqda, ayuu
Rabbiga ciidammadu leeyahay, oo anna waan idiin soo
noqonayaa, ayuu Rabbiga ciidammadu leeyahay. **4** Ha
ahaanina sidii awowayaashiin oo kale, kuwaasoo ahaa
kuwii ay nebiyadii hore ku qayliyeen oo ay ku yidhaahdeen,
Rabbiga ciidammadu wuxuu leeyahay, Hadda ka soo noqda
jidadkiinna sharka ah iyo falimihiinna sharka ahba, laakiinse
Rabbigu wuxuu leeyahay, Iyagu ima ay maqlin, oo innaba ima
ay dhegaysan. **5** Bal meeye awowayaashiin? Nebiyaduse
miyey weligood iska noolaadaan? **6** Laakiinse erayadaydii
iyo qaynuunnadaydii aan nebiyadii addoommadayda ahaa ku
soo amray, sow ma gaadhin awowayaashiin? Oo iyana intay
soo noqdeen ayay yidhaahdeen, Rabbiga ciidammadu siduu
ku fikiray inuu nagu sameeyo, siday jidadkayagu ahaayeen,
iyo siday falimahayagu ahaayeen ayuu nagu sameeyey.
**7** Boqor Daariyus sannaddiisii labaad, bisheedii kow iyo
tobnaad, taasoo ah bisha Shebaad maalinteedii afar iyo
labaatanaad ayaa eraygii Rabbigu u yimid Sekaryaah oo ahaa
ina Berekyaah ina Iddo oo nebigii ahaa, oo wuxuu ku yidhi,
**8** Habeenkii waxaan arkay oo ii muuqday nin faras xamar
ah fuushan, oo wuxuu dhex istaagay geedaha hadaaska
la yidhaahdo oo meel hoos leh ku yiil, oo gadaashiisana
waxaa joogay fardo kale oo midabkoodu yahay xamar
iyo midab dibicyo leh iyo caddaan. **9** Markaasaan idhi,
Sayidkaygiiyow, waa maxay kuwanu? Markaasaa malaggii
ila hadlay igu yidhi, Anigaa ku tusi doona waxa kuwanu
yihiin. **10** Oo ninkii geedaha hadaaska ah dhex taagnaa
ayaa jawaabay oo wuxuu yidhi, Kuwanu waa kuwii Rabbigu
u diray inay dhulka hore iyo dib u dhex maraan. **11** Oo iyana
waxay u jawaabeen malaggii Rabbiga oo geedaha hadaaska
ah dhex taagnaa oo waxay ku yidhaahdeen, Dhulkii hore
iyo dibba waannu u dhex marnay, oo bal eeg, dhulkii oo
dhammu wuu deggan yahay oo wuu xasilloon yahay. **12**
Markaasaa malaggii Rabbigu jawaabay oo wuxuu yidhi,
Rabbiga ciidammadow, ilaa goormaadan u naxariisanayn
Yeruusaalem iyo magaalooyinka dalka Yahuudah, kuwaasoo
aad toddobaatan sannadood u cadhaysnayd? **13** Markaasaa
Rabbigu malaggii ila hadlay ugu jawaabay erayo wanaagsan
oo qabow. **14** Kolkaasaa malaggii ila hadlay igu yidhi,
War qayli, oo waxaad tidhaahdaa, Rabbiga ciidammadu
wuxuu leeyahay, Anigu Yeruusaalem iyo Siyoonba waxaan
ugu masayrsanahay masayr weyn. **15** Oo aad iyo aad
baan ugu cadhooday quruumaha iska istareexsan! Waayo,
anigoo in yar u cadhaysan ayay sii badiyeen dhibaatadii.
**16** Haddaba sidaas daraaddeed Rabbigu wuxuu leeyahay,
Yeruusaalem ayaan naxariis kula soo noqday. Oo Rabbiga
ciidammadu wuxuu leeyahay, Gurigayga waa laga dhisi
doonaa dhexdeeda, oo Yeruusaalem korkeeda waxaa lagu
fidin doonaa xadhig qiyaaseed. **17** Oo haddana qayli oo
waxaad tidhaahdaa, Rabbiga ciidammadu wuxuu leeyahay,
Magaalooyinkaygu mar kalay barwaaqo la faafi doonaan,
oo Rabbigu mar kaluu Siyoon u qalbi qaboojin doonaa, oo
mar kaluu Yeruusaalem dooran doonaa. **18** Oo indhahaygii
baan kor u qaaday, oo wax baan fiiriyey, oo waxaan arkay
afar gees. **19** Oo anna waxaan malaggii ila hadlay ku
idhi, Waa maxay kuwanu? Oo isna wuxuu iigu jawaabay,
Kuwanu waa geesihii kala firdhiyey dadkii dalka Yahuudah
iyo dadkii dalka Israa'iil iyo Yeruusaalemba. **20** Markaasaa
Rabbigu wuxuu i tusay afar tumaal. **21** Kolkaasaan idhi,
Kuwanu maxay u yimaadeen inay sameeyaan? Oo isna wuu
hadlay oo wuxuu yidhi, Kuwanu waa geesihii kala firdhiyey
dadkii dalka Yahuudah si aan ninna madaxiisa ugu qaadin
aawadeed. Laakiinse kuwanu waxay haatan u yimaadeen
inay ka argaggixiyaan, oo ay hoos u tuuraan quruumaha
geesahooda kor ugu qaaday dalka Yahuudah inay kala
firdhiyaan.

**2** Oo anna indhahaygii baan kor u qaaday, oo wax
baan fiiriyey, oo waxaan arkay nin gacanta ku haysta
xadhig qiyaaseed. **2** Kolkaasaan idhi, War xaggee baad
u socotaa? Oo isna wuxuu igu yidhi, Waxaan u socdaa
inaan Yeruusaalem soo qiyaaso oo aan soo ogaado intuu
ballaadhkeedu yahay, iyo intuu dhererkeedu yahayba. **3**
Oo bal eeg, malaggii ila hadlay ayaa baxay, oo malag
kale ayaa u baxay inuu isaga ka hor tago. **4** Oo wuxuu
ku yidhi isagii, Orod, oo la hadal ninkaas dhallinyarada
ah, oo waxaad ku tidhaahdaa, Yeruusaalem waxaa loo
degi doonaa sidii tuulooyin aan deyr lahayn, sababtuna
waa dadka tirobadnaantiisa iyo xoolaha iyada dhex jooga
daraaddood. **5** Waayo, Rabbigu wuxuu leeyahay, Anigu
waxaan iyada u noqon doonaa deyr dab ah oo iyada ku
wareegsan, oo waxaan iyada u noqon doonaa ammaanta
dhexdeeda joogta. **6** Rabbigu wuxuu leeyahay, Warroy
dalka woqooyi ka carara, waayo, Rabbigu wuxuu leeyahay,
Anigu waxaan idiin kala firdhiyey sida afarta dabaylood oo
samada. **7** Siyoonay, tan dadka Baabuloon la joogtoy, baxso.
**8** Waayo, Rabbiga ciidammadu wuxuu leeyahay, Ammaan

dabadeed wuxuu ii soo diray quruumihii adiga ku dhacay,
waayo, kii ku taabto wuxuu taabtaa ishiisa inankeeda. 9
Waayo, bal eega, Gacantayda ayaan iyaga ku kor ruxruxi
doonaa, oo iyana waxay booli u noqon doonaan kuwii iyaga
u adeegi jiray, oo idinna waxaad ogaan doontaan in Rabbiga
ciidammadu i soo diray. 10 Magaalada Siyoonay, gabay oo
reyree, waayo, Rabbigu wuxuu leeyahay, Bal eeg, anigu
waan imanayaa oo dhexdaadaan degganaan doonaa. 11
Oo wakhtigaas quruumo badan ayaa Rabbiga isugu darmi
doona, oo dadkaygay noqon doonaan, oo dhexdaadaan
degganaan doonaa, oo adna waxaad ogaan doontaa in
Rabbiga ciidammadii ii soo kaa diray. 12 Oo Rabbiguna
dadka dalka Yahuudah wuu dhaxli doonaa iyagoo qaybtiisa
ku ah dalka quduuska ah, oo weliba Yeruusaalem buu
dooran doonaa. 13 Binu-aadmiga oo dhammow, Rabbiga
hortiisa ku aamusa, waayo, isagu waa ka soo kacay hoygiisii
quduuska ahaa.

3 Oo wuxuu i tusay Yashuuca oo ah wadaadka sare oo
hor taagan malaggii Rabbiga, iyo Shayddaan oo taagan
gacantiisa midig si uu u ashtakeeyo. 2 Markaas Rabbigu
wuxuu Shayddaan ku yidhi, Shayddaanow, Rabbigu ha ku
canaanto, Rabbiga Yeruusaalem doortay ha ku canaanto.
Sow kanu ma aha qori dab laga dhiftay? 3 Haddaba Yashuuca
dhar wasakhaysan buu qabay, oo wuxuu istaagay malagga
hortiisii. 4 Isagu wuu jawaabay oo la hadlay kuwii isaga hor
taagnaa, oo wuxuu ku yidhi, Dharka wasakhaysan isaga ka
fura. Kolkaasuu isagiina ku yidhi, Bal eeg, xumaantaadii
waan kaa qaaday oo waxaan kuu xidhi doonaa dhar aad u
wanaagsan. 5 Oo anna markaasaan idhi, Duub daahirsan
madaxa ha loo saaro. Markaasaa duub daahirsan madaxa
loo saaray, oo dhar baa loo xidhay, oo malaggii Rabbiga ayaa
ag istaagay. 6 Markaasaa malaggii Rabbigu u caddeeyey
Yashuuca, oo wuxuu ku yidhi, 7 Rabbiga ciidammadu wuxuu
leeyahay, Haddaad jidadkayga ku socotid, oo aad amarkayga
xajisid, markaas waxaad xukumi doontaa gurigayga, oo
weliba waxaad dhawri doontaa barxadahayga, oo anna
kuwa halkan taagan dhexdooda ayaan kaa siin doonaa
meel aad soo gashid. 8 Haddaba Yashuuca oo wadaadka
sare ahow, maqal, adiga iyo saaxiibbadaada ku hor fadhiya,
maxaa yeelay, iyagu waa niman calaamad ah, waayo, bal
eeg, anigu waxaan bixin doonaa addoonkayga Biqilka ah.
9 Waayo, bal eeg dhagaxa aan Yashuuca hortiisa dhigay,
isku dhagax ayaa waxaa ku yaal toddoba indhood. Rabbiga
ciidammadu wuxuu leeyahay, Bal eeg, anigu waan xardhi
doonaa xaradhkiisa, oo dalkaas xumaantiisana maalin qudha
baan ku qaadi doonaa. 10 Oo Rabbiga ciidammadu wuxuu
leeyahay, Wakhtigaas ninkiin kastaaba wuxuu deriskiisa ugu
yeedhi doonaa canabka iyo berdaha hoostooda.

4 Oo haddana malaggii ila hadlay ayaa i toosiyey, sidii
nin hurdo laga soo toosiyey. 2 Oo wuxuu igu yidhi, War
maxaad aragtaa? Oo aniguna waxaan idhi, Waxaan arkaa
oo u jeedaa laambad wada dahab ah, oo maddiibaddeedana
iyaday kor sarantahay, oo toddobadeeda laambadood ee
yaryarna way kor yaalliin, oo waxaa jira toddobada tuubbo
oo ku socota laambad yar oo kasta oo ku kor taal. 3 Oo
agteedana waxaa ku yaal laba geed oo saytuun ah, oo
mid wuxuu ku yaal maddiibadda dhankeeda midig, oo kan
kalena wuxuu ku yaal maddiibadda dhankeeda bidix. 4 Oo
anna waan jawaabay oo la hadlay malaggii ila hadlay oo
waxaan ku idhi, Sayidkaygiiyow, waa maxay kuwanu? 5
Markaasaa malaggii ila hadlay jawaabay oo wuxuu igu yidhi,
War miyaadan aqoon waxa kuwanu yihiin? Oo anna waxaan
ku idhi, Maya, sayidkaygiiyow. 6 Markaasuu jawaabay oo ila
hadlay, oo wuxuu igu yidhi, Kanu waa eraygii Rabbigu u soo
diray Serubaabel, oo wuxuu ku yidhi, Rabbigii ciidammadu
wuxuu leeyahay, Itaal kuma aha, xoogna kuma aha, laakiinse
waxay ku tahay ruuxayga. 7 Buurtan weynay, kumaad tahay?
Serubaabel hortiisa waxaad ku noqon doontaa bannaan. Oo
isna wuxuu soo bixin doonaa dhagaxa madaxa ah isagoo
dhawaaqaya oo leh, Ammaan ha u ahaato, ammaan ha
u ahaato. 8 Oo weliba waxaa ii yimid Eraygii Rabbiga,
oo wuxuu igu yidhi, 9 Serubaabel gacmihiisa ayaa dhigay
gurigan aasaaskiisa, oo weliba gacmihiisaa dhammayn
doona, oo waxaad ogaan doontaa in Rabbiga ciidammadu
ii soo kaa diray. 10 Waayo, bal yaa quudhsaday maalinta
waxyaalaha yaryar? Waayo, iyagu way rayrayn doonaan,
oo waxay arki doonaan xadhigga miisaanka oo ku jira
gacanta Serubaabel, waana toddobadan oo ah indhihii
Rabbiga. Iyagu dhulka oo dhan ayay hore iyo dibba u
fiiriyaan. 11 Markaasaan jawaabay, oo waxaan isagii ku
idhi, Waa maxay labadan geed oo saytuunka ah oo ku yaal
laambadda dhankeeda midig iyo dhankeeda bidixba? 12 Oo
haddana mar labaad baan jawaabay oo waxaan ku idhi,
Waa maxay labadan laamood oo saytuunka ah oo ku ag
yaal labada tuubbo oo dahabka ah oo saliidda dahabka
ah iska madhiya? 13 Oo isna wuu ii jawaabay oo wuxuu
igu yidhi, War miyaadan aqoon waxa kuwanu yihiin? Oo
anna waxaan ku idhi, Maya, sayidkaygiiyow. 14 Oo isna
kolkaasuu igu yidhi, Kuwanu waa labada la subkay oo ag
istaaga Sayidka dhulka oo dhan.

5 Oo haddana indhaha baan kor u taagay oo wax fiiriyey,
oo waxaan arkay qorniin la duubo oo duulaya. 2 Oo isna

wuxuu igu yidhi, War maxaad aragtaa? Oo anna waxaan
ugu jawaabay, Waxaan arkaa qorniin la duubo oo duulaya,
oo dhererkiisu waa labaatan dhudhun, ballaadhkiisuna
waa labaatan dhudhun. 3 Markaasuu igu yidhi, Kanu waa
habaarka soo baxay oo dhulka oo dhan kor maraya, waayo,
ku alla kii wax xada waxaa lagu baabbi'in doonaa sida
dhankiisan ku qoran, oo ku alla kii been ku dhaartana waxaa
lagu baabbi'in doonaa sida dhankiisa kale ku qoran. 4 Oo
Rabbiga ciidammadu wuxuu leeyahay, Anigu waan soo
bixin doonaa, oo wuxuu soo geli doonaa guriga tuugga,
iyo guriga kan magacayga beenta ugu dhaarta, oo wuxuu
iska joogi doonaa gurigiisa dhexdiisa, oo alwaaxdiisa iyo
dhagaxyadiisaba wuu wada baabbi'in doonaa. 5 Markaasaa
malaggii ila hadlay soo baxay, oo wuxuu igu yidhi, Bal hadda
indhaha kor u taag, oo bal arag waxa uu yahay waxan soo
baxaya. 6 Oo waxaan ku idhi, Waa maxay? Kolkaasuu igu
yidhi, Kanu waa weel eefaah ah oo soo baxaya. Oo weliba
wuxuu igu yidhi, Kanu waa muuqashadii dembigooda oo
dhulka oo dhan gaadhay. 7 Oo bal eeg, waxaa kor loo
qaaday wax culus oo laxaamad ah, oo waxaa jirtay naag
eefaahda dhexdeeda fadhida. 8 Oo haddana wuxuu igu
yidhi, Tanu waa xumaan. Kolkaasuu iyadii hoos ugu riday
eefaahda dhexdeeda, oo wuxuu ku daboolay wixii cuslaa oo
laxaamadda ahaa. 9 Oo markaasaan indhaha kor u taagay,
oo intaan wax fiiriyey ayaan arkay laba naagood oo soo
baxay, oo dabayshuna waa ku jirtay baalashooda. Iyagu
waxay lahaayeen baalal u eg baalasha xuurta oo kale, oo
iyana intay eefaahdii kor u qaadeen ayay meel dhulka iyo
samada u dhaxaysa geeyeen. 10 Markaasaan malaggii ila
hadlay ku idhi, Kuwanu xaggee bay eefaahda u qaadayaan?
11 Oo isaguna wuxuu igu yidhi, Waxay u qaadayaan inay
guri iyada uga dhisaan dalka Shincaar, oo markii la diyaariyo
ayaa iyada lagu dejin doonaa halkaas oo meesheeda ah.

6 Oo haddana indhaha baan kor u taagay oo wax fiiriyey,
oo waxaan arkay afar gaadhifaras oo ka soo baxay
laba buurood dhexdood, buuruhuna waxay ahaayeen buuro
naxaas ah. 2 Gaadhifaraska kowaad waxaa waday fardo
xamar ah, gaadhifaraska labaadna waxaa waday fardo
madmadow. 3 Gaadhifaraska saddexaadna waxaa waday
fardo cadcad, gaadhifaraska afraadna waxaa waday fardo
barbaro leh oo xoog badan. 4 Markaasaan jawaabay oo
waxaan malaggii ila hadlay ku idhi, Sayidkaygiiyow, waa
maxay kuwanu? 5 Kolkaasaa malaggii jawaabay oo wuxuu
igu yidhi, Kuwanu waa samada afarteeda dabaylood, oo
ka soo baxa meeshay Sayidka dhulka oo dhan ku hor
taagnaayeen. 6 Gaadhifaraskii fardaha madmadow lahaa
wuxuu tegayaa xagga dalka woqooyi, oo kuwa cadcaduna
iyagay daba gelayaan, oo gaadhifaraskii fardaha barbaraha
leh lahaana wuxuu tegayaa xagga dalka koonfureed. 7
Oo kuwii xoogga badnaana way soo bexeen, oo waxay
doonayeen inay dhulka hore iyo dibba u dhex maraan, oo
isna wuxuu ku yidhi, Taga oo dhulka hore iyo dibba u dhex
mara. Oo iyana markaasay dhulkii hore iyo dibba u dhex
mareen. 8 Markaasuu igu qayliyey, oo intuu ila hadlay ayuu
igu yidhi, Bal eeg, kuwii xagga dalka woqooyi tegey ruuxaygii
way ku qabowjiyeen dalka woqooyi. 9 Oo haddana waxaa
ii yimid Eraygii Rabbiga oo leh, 10 Kuwii maxaabiista loo
kaxaystay waxaad ka soo waddaa Xelday iyo Toobiyaah
iyo Yedacyaah, oo isla maalintaasba kaalay, oo waxaad
gashaa guriga Yoosiyaah ina Sefanyaah oo ay joogaan kuwii
Baabuloon ka yimid. 11 Oo waxaad iyaga ka qaaddaa lacag
iyo dahab, oo waxaad ka samaysaa taaj, oo waxaad madaxa
u saartaa Yashuuca ina Yehoosaadaaq oo ah wadaadka
sare. 12 Isaga la hadal, oo waxaad ku tidhaadaa, Rabbiga
ciidammadu sidanuu u hadlaa oo leeyahay, Bal eega ninka
magiciisu yahay Biqilka. Wuxuu ku kori doonaa meeshiisa,
oo macbudka Rabbiga ayuu dhisi doonaa. 13 Isaga qudhiisa
ayaa dhisi doona macbudka Rabbiga, oo isagu ammaantuu
sidan doonaa, oo carshiga ayuu ku dul fadhiyi doonaa oo
ku talin doonaa. Wuxuu ahaan doonaa wadaad carshigiisa
ku dul fadhiya, oo labadoodaba waxaa u dhaxayn doona
taladii nabaadiinada. 14 Oo taajajka waxaa yeelan doona
Xeelem iyo Toobiyaah iyo Yedacyaah iyo Xeen oo ah ina
Sefanyaah, oo waxayna u ahaan doonaan xusuus macbudka
Rabbiga ku jirta. 15 Oo kuwa meelaha fog jooga ayaa iman
doona oo waxay ka shaqayn doonaan dhisidda macbudka
Rabbiga, oo idinkuna waxaad ogaan doontaan in Rabbiga
ciidammadu uu ii soo kiin diray. Tanu way ahaan doontaa
haddaad ku dadaashaan inaad codka Rabbiga Ilaahiinna ah
addeecdaan.

7 Oo Boqor Daariyus sannaddiisii afraad ayaa eraygii
Rabbigu u yimid Sekaryaah maalintii afraad oo bisha
sagaalaad, taasoo ah bisha Kislee'u. 2 Haddaba reer
Beytel waxay soo direen Shareser iyo Regem Meleg iyo
raggoodiiba inay Rabbiga baryaan, 3 iyo inay la hadlaan
wadaaddadii guriga Rabbiga ciidammada, iyo nebiyadii, oo
ay ku yidhaahdaan, Miyaan bisha shanaad ooyaa, oo miyaan
gooni iska dhigaa sidii aan yeeli jiray sannadahan badan oo
dhan? 4 Oo haddana waxaa ii yimid Eraygii Rabbiga oo
wuxuu igu yidhi, 5 Waxaad la hadashaa dadka dalka deggan
oo dhan iyo wadaaddadaba, oo waxaad ku tidhaahdaa,
Markaad soomi jirteen oo aad barooran jirteen bisha shanaad

iyo bisha toddobaad, oo ah toddobaatankan sannadood,
miyaad innaba aniga ii soomi jirteen? 6 Oo markaad wax
cuntaan, iyo markaad wax cabtaan, miyaydaan nafsaddiinna
u cunin oo miyaydaan nafsaddiinna u cabbin? 7 Sow ma
aha erayadii Rabbigu kaga dhex qayliyey nebiyadii hore,
markii Yeruusaalem la degganaa oo ay barwaaqada ku dhex
jirtay, oo la wada degganaa magaalooyinka hareeraheeda
ku wareegsan iyo xagga koonfureed iyo bannaankaba?
8 Markaasaa eraygii Rabbigu u yimid Sekaryaah, isagoo
leh, 9 Rabbiga ciidammadu sidan buu ku hadlay oo yidhi,
Garsoorid daacad ah naqa, oo nin waluba walaalkiis ha u
sameeyo naxariis iyo raxmad. 10 Hana dulmina carmalka,
ama agoonta, ama qariibka, ama masaakiinta, oo midkiinna
yuusan qalbiga xumaan ugu fikirin walaalkiis. 11 Laakiinse
way diideen inay dhegaystaan, oo intay caasiyeen ayay
dhegaha furaysteen, si ayan u maqlin. 12 Oo waxay
qalbigoodii ka dhigeen sidii dhagax adag oo kale si ayan
u maqlin sharcigii iyo erayadii Rabbiga ciidammadu uu ku
soo dhiibay ruuxiisa markuu nebiyadiisii hore soo diray, oo
sidaas daraaddeed waxaa Rabbiga ciidammada ka timid
cadho weyn. 13 Oo sidii uu u dhawaaqay oo iyana ay maqli
waayeen, sidaas oo kalay u qayliyeen, oo anna ma aan
maqlin, ayaa Rabbiga ciidammadu yidhi, 14 laakiinse waxaan
iyaga ku kala firdhiyey dabayl duufaan ah oo waxaan dhex
geeyey quruumaha ayan aqoon oo dhan. Sidaasuu dalkii
cidla u noqday iyaga dabadood, oo ninna ma dhex marin,
ciduna kuma soo noqon, waayo, dalkii wacnaa cidla baa
laga dhigay.

**8** Markaasaa Eraygii Rabbiga ciidammadu ii yimid, isagoo
leh, 2 Rabbiga ciidammadu wuxuu leeyahay, Siyoon
waxaan ugu qiirooday qiiro aad u weyn, oo waxaan iyada
ugu qiirooday cadho weyn. 3 Rabbigu wuxuu leeyahay,
Siyoon baan ku soo noqday, oo waxaan degganaan doonaa
Yeruusaalem dhexdeeda, oo Yeruusaalem waxaa lagu odhan
doonaa Magaaladii runta, oo buurta Rabbiga ciidammadana
waxaa lagu odhan doonaa Buurta quduuska ah. 4 Rabbiga
ciidammadu wuxuu leeyahay, Yeruusaalem jidadkeeda
waxaa mar kale degganaan doona odayaal iyo habro,
nin kasta isagoo gacanta ku haysta ushiisa cimrigiisa
weynaaday daraaddiis. 5 Oo magaalada jidadkeedana waxaa
ka buuxi doona wiilal iyo gabdho oo jidadka dhexdooda
ku cayaaraya. 6 Rabbiga ciidammadu wuxuu leeyahay,
Wakhtigaas hadday yaab ku tahay dadkan kuwooda hadhay,
ma yaab bay ku ahaanayaan indhahayga? 7 Rabbiga
ciidammadu wuxuu leeyahay, Bal eeg, dadkaygaan ka
badbaadin doonaa dalka bari iyo dalka galbeed. 8 Waanan
keeni doonaa, oo Yeruusaalem way dhex degganaan
doonaan, oo dadkaygii way noqon doonaan oo anna waxaan
noqon doonaa Ilaahooda anoo leh daacadnimo iyo xaqnimo.
9 Rabbiga ciidammadu wuxuu leeyahay, Gacmihiinnu xoog
ha yeesheen, kuwiinna wakhtigan erayadan ka maqla
afka nebiyada kuwaasoo joogay maalintii aasaaskii guriga
Rabbiga ciidammada, kaasoo ah macbudka, loo dhigay si loo
dhiso. 10 Waayo, wakhtigaas ka hor ninna kiro ma lahayn,
neefna kiro ma lahayn innaba, oo kii baxay iyo kii galay toona
nabadu uma jirin cadowga daraaddiis, waayo, dadka oo dhan
nin kasta waxaan ku diray deriskiisa. 11 Laakiinse Rabbiga
ciidammadu wuxuu leeyahay, Haatan dadkan hadhay sidii
waagii hore u ahaan maayo. 12 Waayo, waxaa jiri doona
iniintii nabadda. Geedcanabkuna canabkiisuu dhali doonaa,
oo dhulkuna midhihiisuu soo bixin doonaa, oo samooyinkuna
sayaxay soo deyn doonaan, oo waxaan ka dhigi doonaa in
kuwa dadkan ka hadhay ay waxyaalahan oo dhan dhaxlaan.
13 Dadka dalka Yahuudahow, iyo dadka dalka Israa'iilow,
sidaad quruumaha habaar ugu dhex ahaydeen ayaan idiin
badbaadin doonaa, oo barako baad ku ahaan doontaan.
Ha cabsanina, laakiinse gacmihiinnu xoog ha yeesheen.
14 Waayo, Rabbiga ciidammadu wuxuu leeyahay, Sidii
waagii ay awowayaashiin iiga xanaajiyeen oo aan ugu
fikiray inaan iyaga wax xun ku sameeyo, oo aanan taas
uga soo noqon, 15 sidaas oo kale ayaan haatan ku fikiray
inaan wax wanaagsan ku sameeyo Yeruusaalem iyo dadka
dalka Yahuudah, haddaba ha cabsanina. 16 Idinku waxaad
samaysaan waxyaalahan, ninkiin kastaaba deriskiisa run
ha kula hadlo, oo waxaad irdihiinna ku naqdaan garsoorid
run ah oo nabad keenta, 17 oo midkiinna yuusan qalbiga
xumaan ugu fikirin deriskiisa, oo ha jeclaanina dhaar been
ah, waayo, Rabbigu wuxuu leeyahay, Waxyaalahan oo
dhammu waa waxyaalo aan necbahay. 18 Oo waxaa ii
yimid Eraygii Rabbiga ciidammada, isagoo leh, 19 Rabbiga
ciidammadu wuxuu leeyahay, Soonkii bisha afraad iyo
soonkii bisha shanaad iyo soonkii bisha toddobaad iyo
soonkii bisha tobnaadba waxay dadka dalka Yahuudah u
noqon doonaan farxad iyo rayrayn iyo iido lagu rayreeyo,
haddaba sidaas daraaddeed jeclaada runta iyo nabadda.
20 Rabbiga ciidammadu wuxuu leeyahay, Mar kale waxaa
iman doona dadyow iyo kuwo magaalooyin badan deggan.
21 Oo magaalo dadka deggan waxay u tegi doonaan dad
magaalo kale deggan, oo waxay ku odhan doonaan, Ina
keena aynu dhaqsiyo Rabbiga u barinnee, oo aynu Rabbiga
ciidammada doondoonnee, oo aniguna waan tegi doonaa.
22 Dadyow badan iyo quruumo xoog badanuba waxay
u soo kici doonaan inay Yeruusaalem ka doondoonaan
Rabbiga ciidammada, iyo inay Rabbiga baryaan. 23 Rabbiga

ciidammadu wuxuu leeyahay, Wakhtigaas toban nin oo ka
mid ah quruumaha oo dhammu waxay ku dhegi doonaan mid
Yuhuud ah darafka dharkiisa, iyagoo leh, Annagu waannu
idin raaci doonnaa, waayo, waxaannu maqalnay in Ilaah
idinla jiro.

**9** Kanu waa warka culus ee erayga Rabbiga oo ku saabsan
dalka Xadraag, oo Dimishaqna waa meeshuu joogayo,
waayo, nin kasta iyo qabiilooyinkii reer binu Israa'iil oo
dhammuba waxay indhaha ku taagayaan Rabbiga xaggiisa,
2 iyo weliba Xamaad oo soohdinteeda ku ag taal, iyo weliba
Turos iyo Siidoon, maxaa yeelay, iyadu way caqli badan
tahay. 3 Turos waxay dhisatay qalcad, oo waxay lacag
u urursatay sida ciidda oo kale, iyo dahab saafiya sida
dhoobada jidadka dhex taal oo kale. 4 Bal eeg, Sayidku
iyada wuu hantiyi doonaa, oo xooggeedana badduu ku
tuuri doonaa, oo dab baa dhammayn doona. 5 Ashqeloon
way arki doontaa, wayna cabsan doontaa, oo Gaasana
way arki doontaa oo aad bay u xanuunsan doontaa,
Ceqroonna way cabsan doontaa, waayo, waxfilashadeedii
way dhammaan doontaa, oo Gaasana boqorku wuu ka
baabbi'i doonaa, Ashqeloonna lama degganaan doono. 6
Ashdoodna reer garac baa dhex degganaan doona, oo
kibirka reer Falastiinna waan baabbi'in doonaa. 7 Waxaan
afkooda ka soo bixin doonaa dhiiggooda, oo ilkahooda
dhexdoodana karaahiyadoodaan ka soo bixin doonaa, oo
iyaguna Ilaahayagay dad hadhay u ahaan doonaan, oo sida
ugaas dalka Yahuudah dhex jooga oo kale ayay ahaan
doonaan, oo Ceqroonna waxay noqon doontaa sida reer
Yebuus. 8 Oo gurigayga hareerihiisa waan degi doonaa
inaan ciidanka ka hor joogsado, inaan ninna ka dhex marin
ama ku soo noqon, oo mar dambena mid wax dulma
iyaga ma dhex mari doono, waayo, haatan indhahaygaan
ku arkay. 9 Magaalada Siyoonay, si weyn u reyree,
magaalada Yeruusaalemay, qayli. Bal eeg, boqorkaagu waa
kuu imanayaa. Isagu waa xaq oo guul buu leeyahay, waana
qalbi qabow yahay, oo wuxuu fuushan yahay dameer ah
qayl dameereed. 10 Oo anigu Efrayim gaadhifardood kasta
waan ka baabbi'in doonaa, oo Yeruusaalemna faras kuma
reebi doono, oo qaansada dagaalkana waa la baabbi'in
doonaa. Isna quruumaha nabad buu kula hadli doonaa, oo
dowladnimadiisuna waxay gaadhi doontaa bad ilaa baddeeda
kale, iyo tan iyo Webiga iyo xataa dhulka darafyadiisa. 11 Oo
weliba adigana dhiiggii axdigaaga daraaddiis maxaabiistaadii
waan ka soo bixiyey godkii aan biyuhu ku jirin. 12 Ku noqda
qalcadda, maxaabiistiinna rajada lahow, maantadan ayaan
caddaynayaa inaan laba jibbaar idin siinayo. 13 Waayo,
dadka Yahuudah sida qaanso baan u xootay, oo reer Efrayim
sida fallaadh oo kale ayaan qaansadii u gashaday. Siyoonay,
wiilashaada waan kicin doonaa, Gariigow, iyagaan ku kicin
doonaa wiilashaada, oo waxaan kaaga dhigi doonaa sida
seef nin xoog badanu haysto. 14 Oo Rabbigiina waa lagu arki
doonaa korkooda, oo fallaadhihiisuna waa u soo bixi doonaan
sida hillaac. Oo Sayidka Rabbiga ahu buunkuu afuufi doonaa,
oo wuxuu raaci doonaa dabaylo cirwareen ah ee koonfureed.
15 Rabbiga ciidammada ayaa daafici doona iyaga, oo way
baabbi'in doonaan, oo waxay ku tuman doonaan dhagaxyada
wadhafka, oo khamri bay cabbi doonaan oo waxay u qaylin
doonaan sida iyagoo sakhraansan, oo waxay u buuxsami
doonaan sida maddiibado, iyo sida rukummada meesha
allabariga. 16 Oo wakhtigaas ayaa Rabbiga Ilaahooda ahu
dadkiisa badbaadin doonaa sida iyagoo idihiisa ah, waayo,
waxay ahaan doonaan sida dhagxan qaali ah oo taaj ku jira
oo dalkiisa ka kor dhalaalaya. 17 Barwaaqadiisu badanaa
oo quruxdiisu weynaan badanaa! Barbaarrada hadhuudh
baa barwaaqayn doonaa, gabdhahana khamri cusub baa
barwaaqayn doona.

**10** Xilliga roobka dambe roob ka barya Rabbiga, isagoo
ah Rabbiga hillaaca sameeya, oo iyaguu siin doonaa
roob wanaagsan, oo wuxuu qof kasta beerta ku siin doonaa
doog. 2 Waayo, teraafiimkii waxay ku hadleen wax aan
waxba ahayn, waxsheegayaashiina wax been ah bay
arkeen, oo waxay sheegeen riyooyin been ah, oo si aan
waxtar lahayn ayay ugu qalbi qaboojiyaan, haddaba sidaas
daraaddeed waxay u ambadaan sida ido oo kale, oo aad bay
u dhibtoodaan, maxaa yeelay, adhijir ma leh. 3 Adhijirrada
aad baan ugu cadhooday, oo waxaan ciqaabi doonaa orgida,
waayo, Rabbiga ciidammadu wuxuu soo booqday idihiisii
ahaa dadka dalka Yahuudah, oo wuxuu ka dhigi doonaa sida
faraskiisa sharafta leh oo dagaalka ku jira. 4 Waxaa isaga
ka iman doona dhagaxa rukunka, oo dhidibkuna isaguu
ka iman doonaa, qaansada dagaalkuna isagay ka iman
doontaa, oo taliye kastaana isaguu ka iman doonaa. 5 Oo
iyana waxay ahaan doonaan sida rag xoog badan oo dagaal
gala oo cadowgooda kula tunta dhoobada jidadka dhex
taal. Wayna diriri doonaan, maxaa yeelay, Rabbiga ayaa
iyaga la jira. Oo kuwa fardaha ku joogaana way isku qasmi
doonaan. 6 Reer Yahuudah waan xoogayn doonaa, waanan
badbaadin doonaa reer Yuusuf, oo mar kalaan soo celin
doonaa, waayo, waan u naxariisanayaa, oo waxay noqon
doonaan sidii iyagoo aanan xoorin, waayo, waxaan ahay
Rabbiga Ilaahooda ah, oo waan maqli doonaa iyaga. 7 Oo
kuwa reer Efrayimna waxay noqon doonaan sida nin xoog

badan, oo qalbigooduna wuxuu u rayrayn doonaa sidii iyagoo
khamri ka wabxay, oo carruurtooduna way arki doonaan, oo
way rayrayn doonaan, oo qalbigooduna waa ku farxi doonaa
Rabbiga. 8 Anigu waan u foodhyi doonaa iyaga, oo waan
isu soo wada ururin doonaa, waayo, waan soo furtay, oo
waxay u badan doonaan siday u badnaan jireen. 9 Waxaan
iyaga ku beeri doonaa dadyowga dhexdooda, wayna igu soo
xusuusan doonaan waddammo fog. Way noolaan doonaan
iyaga iyo carruurtooda, oo way soo noqon doonaan. 10 Mar
kalaan ka soo bixin doonaa dalkii Masar, Ashuurna waan ka
soo ururin doonaa, oo waxaan iyaga keeni doonaa dalka
Gilecaad iyo Lubnaan, oo weliba meel looma heli doono.
11 Oo isagu wuxuu dhex mari doonaa badda dhibaatada,
oo wax buu ku dhufan doonaa hirarka badda, oo Webi
Niil moolkiisuna waa engegi doonaa, oo kibirka Ashuurna
waa la soo dejin doonaa, oo usha boqortooyada Masarna
way iska baabbi'i doontaa. 12 Oo iyagaan ku xoogayn
doonaa Rabbiga, oo hor iyo dibba way ugu socon doonaan
magiciisa, ayaa Rabbigu leeyahay.

11 Lubnaanay, albaabbadaada fur in dab baabbi'iyo
geedahaaga kedarka ah. 2 Geed beroosh ahow, ooya,
waayo, geedkii kedarka ahaa waa dhacay, maxaa yeelay,
kuwii qurqurxoonaa waa la kharribay. Kuwiinna geedaha
alloonka ah oo Baashaan yahow, ooya, waayo, kayntii
adkayd waa dhacday. 3 Waxaa yeedhaya codkii baroortii
adhijirrada! Waayo, sharaftoodii waa la kharribay! Waxaa
yeedhaya codkii cida aaran libaaxyada! Waayo, kibirkii
Urdun waa la kharribay. 4 Rabbiga Ilaahayga ahu wuxuu
yidhi, Daaji idaha la qalayo. 5 Kuwii hantidooda lahaa way
gowracaan, oo isumana ay haystaan inay eed leeyihiin, oo
kuwa iyaga soo iibiyaana mid kastaaba wuxuu leeyahay,
Mahad waxaa leh Rabbiga, waayo, taajir baan noqday, oo
adhijirradooduna uma ay naxaan iyaga. 6 Waayo, Rabbigu
wuxuu leeyahay, Anigu mar dambe u sii nixi maayo dadka
dalka deggan, laakiinse bal eeg, nin kastaba waxaan ku
ridi doonaa gacanta deriskiisa, iyo gacanta boqorkiisa, oo
iyana dalkay ku dhufan doonaan, oo gacantooda kama
aan samatabbixin doono. 7 Markaasaan daajiyey idaha
la qalayo, oo sida xaqiiqada ah waxay ahaayeen idaha
ugu miskiinsan. Oo waxaan soo qaatay laba ulood, oo
mid waxaan u bixiyey Raallinimo, middii kalena waxaan u
bixiyey Xidhiidh, oo idihii waan daajiyey. 8 Oo saddexdii
adhijirba isku bil baan baabbi'iyey, waayo, naftaydu way
ka daashay, oo weliba naftooduna way iga neceen. 9
Markaasaan idhi, Anigu idin daajin maayo. Kii dhimanayaa
ha dhinto, kii halligmayaana ha halligmo, oo intii hadhana
mid waluba kan kale hilibkiisa ha cuno. 10 Oo waxaan soo
qaatay ushaydii aan Raallinimo u bixiyey, oo waan kala
jebiyey, si aan u jebiyo axdigaygii aan dadyowga oo dhan
la dhigtay. 11 Oo maalintaasuu jabay, oo sidaasay kuwii
idaha u miskiinsanaa oo i dhegaystay u ogaadeen in kaasu
yahay Eraygii Rabbiga. 12 Oo waxaan iyagii ku idhi, Hadday
idinla wanaagsan tahay, kiradaydii i siiya, haddii kalese iska
daaya. Sidaas daraaddeed waxay kiradaydii iigu miisaameen
soddon gogo' oo lacag ah. 13 Oo Rabbigu wuxuu igu yidhi,
Dheryasameeyaha u tuur qiimihii wanaagsanaa oo ay igu
qiimeeyeen. Oo anna waxaan soo qaaday soddonkii gogo'
oo lacagta ahaa, kolkaasaan guriga Rabbiga ugu tuuray
dheryasameeyaha. 14 Oo haddana waxaan kala jebiyey
ushaydii kale oo aan Xidhiidh u bixiyey, inaan kala gooyo
walaalnimadii dadka dalka Yahuudah iyo dadka dalka Israa'iil
ka dhexaysay. 15 Oo Rabbigu wuxuu igu yidhi, Haddana mar
kale waxaad qaadataa adhijir nacas ah alaabtiis. 16 Waayo,
bal eeg, waxaan dalka ka dhex kicin doonaa adhijir aan soo
booqanayn kuwa ambaday, oo aan doondoonayn kuwa kala
firdhay, oo aan bogsiinayn kii jaban, oo aan daajinayn kii
feyow, laakiinse isagu wuxuu cuni doonaa hilibka baruurta,
oo raafafkoodana wuu kala dildillaacin doonaa. 17 Waxaa
iska hoogay adhijirka waxtarlaawaha ah oo adhiga isaga
taga! Seef baa ku dhici doonta gacantiisa iyo ishiisa midig.
Gacantiisu dhammaanteed way engegi doontaa, oo ishiisa
midigna kulligeed way madoobaan doontaa.

12 Kanu waa warka culus ee erayga Rabbiga oo ku
saabsan dalka Israa'iil. Rabbigii samada kala bixiyey,
oo aasaaska dhulka dhigay, oo dadka naftiisa ku dhex
sameeyey wuxuu leeyahay, 2 Bal eeg, Yeruusaalem waxaan
koob lagu dhacdhaco uga dhigi doonaa dadka ku wareegsan
oo dhan, iyo weliba dalka Yahuudah, markii Yeruusaalem la
hareereeyo. 3 Oo waxay wakhtigaas ahaan doontaa inaan
Yeruusaalem dhagax culaab badan uga dhigo dadyowga
oo dhan, oo intii isku culaabaysa oo dhammuna aad bay u
dhaawacmi doonaan, oo quruumaha dhulka oo dhammuna
iyaday isu soo urursan doonaan inay la dagaallamaan. 4
Rabbigu wuxuu leeyahay, Wakhtigaas faras kasta waan
argaggixin doonaa, oo kan ku joogana waalli baan ku ridi
doonaa, laakiin indhaha baan ku hayn doonaa dadka dalka
Yahuudah, markaan faras kasta oo dadyowga indhatiro.
5 Oo taliyayaasha dalka Yahuudahna waxay qalbiga iska
odhan doonaan, Kuwa Yeruusaalem deggan xooggii ay
Rabbiga ciidammada oo Ilaahooda ah ka heleen waa inoo
xoog. 6 Wakhtigaas taliyayaasha dalka Yahuudah waxaan
ka dhigi doonaa sida girgire dab ah oo qoryo ku dhex jira, iyo

sida qori ololaya oo xidhmooyin hadhuudh ah ku dhex jira,
oo iyana waxay wada baabbi'in doonaan dadyowga iyaga ku
wareegsan oo dhan, kuwa midigta ka xiga iyo kuwa bidixda
ka xigaba, oo reer Yeruusaalemna mar kalay degganaan
doonaan meeshooda, taasoo ah Yeruusaalem qudheeda. 7
Oo weliba Rabbigu wuxuu marka hore badbaadin doonaa
teendhooyinka dadka Yahuudah, in sharafta reer Daa'uud iyo
sharafta dadka Yeruusaalem degganu ayan ka sii weynaan
tan dadka Yahuudah. 8 Wakhtigaas Rabbigu wuxuu daafici
doonaa dadka Yeruusaalem deggan, oo kii iyaga ugu
tabaryaru wakhtigaas wuxuu ahaan doonaa sida Daa'uud
oo kale, oo reer Daa'uudna wuxuu noqon doonaa sida
Ilaah oo kale, iyo sida malaa'igtii Rabbiga oo iyaga hor
socota. 9 Oo wakhtigaas waxaan doondoonayaa inaan wada
baabbi'iyo quruumaha Yeruusaalem ku kaca oo dhan. 10 Oo
reer Daa'uud iyo dadka Yeruusaalem degganba waxaan
ku shubi doonaa ruuxa raxmadda iyo baryootanka, oo
waxay arki doonaan aniga oo ah kii ay wareemeen, oo
iyana isagay ugu barooran doonaan sida mid ugu baroorto
wiilkiisa madiga ah, oo aad bay ugu murugoon doonaan
isaga, sida mid ugu murugoodo curadkiisa. 11 Wakhtigaas
Yeruusaalem waxaa jiri doonta baroorasho weyn oo ah sidii
baroorashadii Hadad-Rimmoon taasoo ku dhex tiil dooxada
Megiddoo. 12 Oo dalkuna waa wada barooran doonaa,
qoys kastaba gooni ahaantiisa, qoyska reer Daa'uud gooni
ahaantiis, naagahooduna gooni ahaantood, qoyska reer
Naataanna gooni ahaantiis, naagahooduna gooni ahaantood,
13 qoyska reer Laawina gooni ahaantiis, naagahooduna
gooni ahaantood, qoyska reer Shimciina gooni ahaantiis,
naagahooduna gooni ahaantood, 14 qoysaska hadhay oo
dhan, mid kastaba gooni ahaantiis, naagahooduna gooni
ahaantood.

**13** Wakhtigaas waxaa reer Daa'uud iyo dadka
Yeruusaalem degganba u furmi doonta il dembiga iyo
nijaasta lagaga maydho. 2 Rabbiga ciidammadu wuxuu
leeyahay, Waxay wakhtigaas noqon doontaa inaan dalka
dhexdiisa ka wada baabbi'iyo magacyada sanamyada, oo
mar dambena iyaga lama soo xusuusan doono, oo weliba
waxaan ka dhigi doonaa inay nebiyada beenta ah iyo ruuxa
wasakhda ahuba dalka ka dhex baxaan. 3 Oo markii mid wax
sii sheego, aabbihiis iyo hooyadiisii dhalay waa inay isaga ku
yidhaahdaan, Waa inaadan sii noolaan, waayo, been baad
magaca Rabbiga ku sheegtaa. Oo aabbihiis iyo hooyadiisii
dhalay waa inay isaga wareemaan intuu wax sii sheegayo. 4
Oo wakhtigaas nebiyada midkood kastaaba wuu ku ceeboobi
doonaa riyadiisii markuu wax sii sheegayo, mana ay xidhan
doonaan dhar dhogor badan oo ay wax ku khiyaanaan.
5 Laakiinse wuxuu odhan doonaa, Anigu nebi ma ahi, ee
waxaan ahay dhulbeerte, waayo, tan iyo yaraantaydii baa
lay addoonsanayay. 6 Oo waxaa lagu odhan doonaa, Waa
maxay nabrahan gacmahaaga ku yaalla? Oo isna wuxuu
ugu jawaabi doonaa, Waa kuwii laygu dhaawacay anigoo
guriga saaxiibbaday jooga. 7 Rabbiga ciidammadu wuxuu
leeyahay, Seefay, toos oo ku kac adhijirkayga iyo ninka
wadaygayga ah. Adhijirka dil, oo iduhuna way kala firdhi
doonaan, oo gacantaydaan ku soo celin doonaa kuwa yaryar.
8 Oo Rabbigu wuxuu leeyahay, Waxay noqon doontaa in
dalka oo dhan laba dalool baabba'do oo dhimato, laakiinse
daloolka saddexaad wuu hadhi doonaa. 9 Oo anna daloolka
saddexaad dab baan dhex marsiin doonaa, oo waxaan u
kala miiri doonaa sida lacag loo miiro, oo waxaan u tijaabin
doonaa sida dahabka loo tijaabsho. Magacaygay igu baryi
doonaan oo anna waan maqli doonaa, oo waxaan odhan
doonaa, Iyagu waa dadkaygii, oo iyana midkood kastaaba
wuxuu odhan doonaa, Rabbigu waa Ilaahay.

**14** Bal eeg, waxaa imanaysa maalintii Rabbiga ee waxaagii
la dhacay dhexdaada lagu qaybsan doono. 2 Waayo,
quruumaha oo dhan waan u soo wada ururin doonaa inay
Yeruusaalem la diriraan, oo magaalada waa la qabsan
doonaa, guryahana waa la dhici doonaa, naagahana waa la
kufsan doonaa, oo magaalada badhkeedna maxaabiis ahaan
baa loo kaxaysan doonaa, laakiinse dadka intiisii hadhay
magaalada lagama baabbi'in doono. 3 Markaasaa Rabbigu
soo bixi doonaa, oo quruumahaas buu la diriri doonaa, siduu
u diriray maalintii dagaalka. 4 Oo maalintaas cagihiisu waxay
ku istaagi doonaan Buur Saytuun, taasoo Yeruusaalem ka
horraysa oo xagga bari ka xigta, oo Buur Saytuunna dhexday
uga kala dillaaci doontaa xagga bari iyo xagga galbeed, oo
waxaa jiri doonta dooxo aad u weyn, oo buurta badhkeed
wuxuu u durki doonaa xagga woqooyi, oo badhkeeda kalena
wuxuu u durki doonaa xagga koonfureed. 5 Markaasaad
ku carari doontaan dooxadii buurahayga, waayo, dooxada
buuruhu waxay gaadhi doontaa tan iyo Aaseel. Oo waxaad u
carari doontaan sidaad ugu hor cararteen dhulgariirkii dhacay
wakhtigii Cusiyaah boqorka ka ahaa dalka Yahuudah. Oo
Rabbiga Ilaahayga ahu wuu iman doonaa, oo waxaa la iman
doonaa kuwa quduuska ah oo dhan. 6 Oo waxay maalintaas
noqon doontaa in iftiinku uusan yeelanayn dhalaal iyo gudcur
toona, 7 laakiinse waxay ahaan doontaa maalin uu Rabbigu
og yahay, taasoo aan maalin ahayn, oo aan habeenna
ahayn, laakiinse waxay ahaan doontaa in markay fiidkii tahay
uu iftiin jiri doono. 8 Oo waxay maalintaas noqon doontaa

inay biyo noolu Yeruusaalem ka soo baxaan, oo badhkood
wuxuu u qulquli doonaa xagga badda bari, oo badhkooda
kalena wuxuu u qulquli doonaa xagga badda galbeed,
oo waxay ahaan doontaa wakhtiga kulaylka iyo wakhtiga
qabowga. **9** Oo Rabbigu boqor buu ka ahaan doonaa
dunida oo dhan, oo maalintaas Rabbigu mid buu ahaan
doonaa, oo magiciisuna mid buu ahaan doonaa. **10** Oo dalka
oo dhammuna wuxuu u rogman doonaa sida Caraabaah,
tan iyo Gebac iyo ilaa Rimmoon oo Yeruusaalem xagga
koonfureed ka jirta. Oo Yeruusaalemna kor baa loo qaadi
doonaa oo waxay iska degganaan doontaa meesheeda,
tan iyo iridda Benyaamiin iyo ilaa meesha iridda kowaad,
iyo ilaa iridda geeska ku taal, iyo tan iyo munaaradda
Xananeel iyo ilaa boqorka macsarooyinkiisa khamriga. **11** Oo
dad baa dhexdeeda degganaan doona, oo innaba habaar
dambe ma jiri doono, laakiinse Yeruusaalem si ammaan ah
ayay u degganaan doontaa. **12** Oo tanuna waa belaayada
Rabbigu ku dhufan doono dadyowga Yeruusaalem la diriray
oo dhan. Iyagoo cagahooda ku taagan ayaa hilibkoodu
iska dhammaan doona, oo indhahoodu waxay ku dhex
baabbi'i doonaan godadkooda, carrabkooduna afkooda. **13**
Oo wakhtigaas rabshad weyn oo xagga Rabbiga ka timid
ayaa dhexdooda jiri doonta, oo midkood kastaaba wuxuu
qabsan doonaa gacanta deriskiisa, oo gacantiisu waxay ku
kici doontaa gacanta deriskiisa. **14** Oo weliba dadka dalka
Yahuudah Yeruusaalem bay ku dagaallami doonaan, oo
maalka quruumaha hareeraheeda ku wareegsan oo dhanna
waa la soo wada ururin doonaa, kaasoo ah dahab iyo
lacag iyo dhar aad u badan. **15** Oo saasay noqon doontaa
belaayada faraska, iyo tan baqalka, iyo tan awrka, iyo tan
dameerka, oo xayawaanka xerooyinkaas jooga oo dhanba
waxaa ku dhici doonta belaayadan. **16** Oo waxay noqon
doontaa in mid kasta oo ka hadhay quruumihii Yeruusaalem
ku soo kacay oo dhan uu u kici doono inuu soo caabudo
Boqorka ah Rabbiga ciidammada, iyo inuu soo dhawro Iiddii
Waababka. **17** Oo qolooyinka dhulka deggan oo dhan ku alla
kii aan Yeruusaalem ugu kicin inuu soo caabudo Boqorka ah
Rabbiga ciidammada innaba roob kuma di'i doono. **18** Oo
haddii uusan reer Masar u kicin, oo uusan iman, iyagana
roob kuma di'i doono, oo waxaa jiri doonta belaayo taasoo
Rabbigu ku dhufan doono quruumihii aan u kicin inay soo
dhawraan Iiddii Waababka. **19** Taasu waxay ahaan doontaa
ciqaabta Masar, iyo ciqaabta dhammaan quruumaha aan u
kicin inay soo dhawraan Iiddii Waababka. **20** Wakhtigaas
dawannada fardaha waxaa ku qornaan doona, WAA U
QUDUUS RABBIGA, oo dheryaha guriga Rabbiga ku jiraana
waxay ahaan doonaan sida maddiibadaha meesha allabariga
hor yaal. **21** Oo xataa dheri kasta oo Yeruusaalem dhex yaal
iyo mid kasta oo dalka Yahuudah dhex yaalba quduus buu u
ahaan doonaa Rabbiga ciidammada, oo kuwa allabariga
bixiya oo dhammu way iman doonaan oo intay qaataan ayay
wax ku karsan doonaan, oo wakhtigaas ka dib mid reer
Kancaan ahu guriga Rabbiga ciidammada kuma jiri doono.

# Malaakii

1 Kanu waa warka culus ee Eraygii Rabbiga oo Malaakii
loogu soo dhiibay dadka dalka Israa'iil. 2 Rabbigu
wuxuu leeyahay, Anigu waan idin jeclaaday, laakiinse
idinku waxaad tidhaahdaan, War sidee baad noo jeclaatay?
Ceesaw sow Yacquub walaalkiis ma ahayn? ayaa Rabbigu
leeyahay, laakiinse Yacquub waan jeclaaday, 3 Ceesawse
waan necbaaday, oo buurihiisiina cidla baan ka dhigay,
oo dhaxalkiisiina waxaan siiyey dawacooyinka cidlada.
4 In kastoo reer Edom yidhaahdaan, Annaga waa nala
dumiyey, laakiinse waannu soo noqon doonnaa, oo
meelaha cidlada ah waannu dhisi doonnaa, Rabbiga
ciidammaduse wuxuu leeyahay, Way dhisi doonaan,
laakiinse anigu waan dumin doonaa, oo dadku wuxuu ku
magacaabi doonaa, Dalka Xumaanta, iyo dadka uu Rabbigu
weligiis u cadhaysan yahay. 5 Oo indhihiinnuna way arki
doonaan, oo idinku waxaad odhan doontaan, Rabbigu ha
laga weyneeyo soohdinta dalka Israa'iil shishadeeda. 6
Wiil wuxuu murweeyaa aabbihiis, addoonna sayidkiisa,
haddaba haddii aan aabbe ahay, meeday murwaddaydii?
Haddiise aan sayid ahay, meeday cabsidaydii? Wadaaddada
magacayga quudhsadayow, Rabbiga ciidammadu saasuu
idinku leeyahay. Idinkuna waxaad leedihiin, War sidee baannu
magacaaga u quudhsannay? 7 Idinku cunto nijaasooday
ayaad meeshayda allabariga ku dul bixisaan, oo weliba
waxaad leedihiin, War sidee baannu kuu nijaasaynay?
Taas waxaad ku tidhaahdaan, Miiska Rabbigu waa mid
la quudhsado. 8 Rabbiga ciidammadu wuxuu leeyahay,
Markaad neef indha la' allabari u bixisaan, sow taasu shar
ma aha? Sowse shar ma aha markaad neef curyaan ah iyo
neef buka allabari u bixisaan? Haddaba bal taliyahaaga u
gee. Miyuu kugu farxi doonaa? Miyuuse ku aqbali doonaa?
9 Haddaba waan idin baryayaaye, Rabbiga barya inuu inoo
roonaado aawadeed. Haddaba idinkoo waxaas sameeyey,
miyuu midkiinna aqbalayaa? Saasuu Rabbiga ciidammadu
leeyahay. 10 Waxaan jeclaan lahaa inuu idinku dhex jiro
mid albaabbada xidha, inaydaan meeshayda allabariga
dab ugu shidin si aan waxtar lahayn! Rabbiga ciidammadu
wuxuu leeyahay, Anigu idinkuma faraxsani, oo gacmihiinnana
innaba qurbaan ka aqbali maayo. 11 Rabbiga ciidammadu
wuxuu leeyahay, Markii qorraxdu soo baxdo iyo markii ay
dhacdo inta ka dhexle magacaygu waa ku weyn yahay
quruumaha dhexdooda, oo meel kastana waxaa magacayga
aawadiis loo bixiyaa foox iyo qurbaan daahir ah, waayo,
magacaygu waa ku weyn yahay quruumaha dhexdooda. 12
Idinkuse waad nijaasaysaan markaad tidhaahdaan, Miiskii
Rabbigu waa nijaasaysan yahay, oo cuntadiisuna waa wax la
quudhsado. 13 Rabbiga ciidammadu wuxuu leeyahay, Idinku
waxaad tidhaahdaan, Bal eega, kanu daal badanaa! Oo
weliba waad igu fududaysateen, oo waxaad ii keenteen wax
la soo dhacay, iyo neef curyaan ah, iyo mid buka, oo saasaad
qurbaan u keentaan. Rabbiga ciidammadu wuxuu leeyahay,
Miyaan gacantiinna ka aqbalaa wax sidaas ah? 14 Laakiinse
inkaaru ha ku dhacdo khaa'inkii adhigiisa neef wanaagsan
oo lab ahu ku jiro, oo markuu nidar galo uu Sayidka u
allabaryo wax iin leh, waayo, Rabbiga ciidammadu wuxuu
leeyahay, Anigu waxaan ahay Boqor weyn, oo magacaygana
aad baa looga cabsadaa quruumaha dhexdooda.

2 Haddaba, wadaaddadow, amarkan idinkaa laydiin soo
diray. 2 Oo Rabbiga ciidammadu wuxuu leeyahay, Haddii
aydaan dhegaysan, oo aydaan qalbigiinna gelin si aad
magacayga u ammaantaan aawadeed, markaas waxaan
idinku soo dejin doonaa inkaartii, oo barakooyinkiinnana
waan inkaari doonaa, oo mar horaan inkaaray, maxaa yeelay,
qalbigiinna ma aad gelisaan. 3 Bal eega, farcankiinnaan
canaanan doonaa, oo wejigiinnana waxaan ku firdhin doonaa
uus, kaasoo ah uuska allabaryadiinna, oo waa laydinla qaadi
doonaa. 4 Rabbiga ciidammadu wuxuu leeyahay, Waxaad
ogaan doontaan inaan anigu amarkan idiin soo diray, si uu
axdigaygu reer Laawi ula sii jiro. 5 Axdigaygii aan iyaga
la dhigtay wuxuu ahaa mid nolol iyo nabaadiino ah, oo
waxaan u siiyey inay iga cabsadaan, wayna iga cabsadeen,
oo magacaygana way ka cabsadeen. 6 Sharcigii runtu
afkooduu ku jiray, oo bushimihoodana xaqdarro lagama
helin. Way igula socdeen nabaadiino iyo qummanaan, qaar
badanna xumaan bay ka leexiyeen. 7 Waayo, bushimaha
wadaadka waxaa waajib ku ah inay aqoonta dhawraan, oo
waxaa ku habboon in sharciga afkiisa laga doono, waayo,
isagu waa wargeeyihii Rabbiga ciidammada. 8 Laakiinse
idinku jidkii baad ka baydheen, oo dad badan baad sharciga
ku kufiseen, oo axdigii reer Laawina waad kharribteen,
ayaa Rabbiga ciidammadu leeyahay. 9 Haddaba sidaas
daraaddeed waxaan dadka oo dhan hortiisa idinkaga dhigay
wax la quudhsado oo hooseeya, maxaa yeelay, jidadkayga
ma aydaan dhawrin, laakiinse dadka baad ugu kala eexateen
sharciga. 10 Miyaynan kulligeen isku aabbe ahayn? Sow
isku Ilaah inama uumin? Bal maxaa ninkeen kastaaba
walaalkiis u khiyaaneeyaa, innagoo nijaasaynayna axdigii
awowayaasheen? 11 Dadka dalka Yahuudah khiyaano bay
ku macaamiloodeen, oo dalka Israa'iil iyo Yeruusaalemna
waxaa lagu sameeyey wax karaahiyo ah, waayo, dadka dalka
Yahuudah waxay nijaaseeyeen meeshii quduuska ahayd ee

Rabbiga oo uu jecelyahay, oo waxay guursadeen gabdho
ilaahoodu qalaad yahay. 12 Rabbigu wuxuu teendhooyinka
reer Yacquub uga baabbi'in doonaa ninkii waxan sameeya,
kan toosa iyo kan ka jawaaba, iyo weliba kan qurbaan u
bixiya Rabbiga ciidammadaba. 13 Oo weliba waxaa kaloo
aad samaysaan tan: Meesha allabariga ee Rabbiga ayaad
ku dul badisaan ilmo, iyo oohin, iyo taahid, sababtuna
waa qurbaanka uusan innaba mar dambe dan ka lahayn,
oo uusan raalli ka ahayn inuu gacantiinna ka aqbalo. 14
Oo idinku waxaad tidhaahdaan, Waa maxay sababtu?
Maxaa yeelay, Rabbigu wuxuu ahaa markhaati u dhexeeya
midkiin kasta iyo naagtii dhallinyaranimadiisa oo uu khiyaano
kula macaamilooday in kastoo ay tahay weheshiisii iyo
naagtii uu axdiga la dhigtay. 15 Oo miyuusan mid ka
dhigin in kastoo uu lahaa waxa ruuxa ka hadhay? Oo
muxuu mid uga dhigay? Isagu wuxuu doonayay farcan Ilaah
caabuda. Sidaas daraaddeed iska jira, oo midkiinna yuusan
khiyaano kula macaamiloon naagtii uu dhallinyaraanta ku
guursaday. 16 Waayo, Rabbiga ah Ilaaha reer binu Israa'iil
wuxuu leeyahay, Anigu waan necbahay furidda, oo Rabbiga
ciidammadu wuxuu leeyahay, Anigu waan necbahay kii
dharkiisa dulmi ku deda, haddaba sidaas daraaddeed iska
jira oo khiyaano ha ku macaamiloonina. 17 Waxaad Rabbiga
ku daaliseen erayadiinna, oo weliba waxaad tidhaahdaan,
War sidee baannu isaga u daalinnay? Waad daalisaan
markaad tidhaahdaan, Ku alla kii shar falaaba waa ku
wanaagsan yahay Rabbiga hortiisa, oo isagu wuu ku farxaa.
Amase markaad tidhaahdaan, Meeh Ilaahii caddaaladdu?

3 Rabbiga ciidammadu wuxuu leeyahay, Bal eega,
waxaan soo dirayaa wargeeyahayga, oo isna jidka ayuu
hortayda ku sii diyaargarayn doonaa. Oo Sayidka aad
doondoonaysaanna dhaqsiyuu macbudkiisa u iman doonaa,
oo bal eega, wargeeyihii axdiga oo aad ku faraxdaanna
wuu imanayaa. 2 Laakiinse bal yaa u adkaysan kara
maalinta imaatinkiisa? Bal yaase taagnaan doona markuu
muuqdo? Waayo, isagu waa sida dabka lacagmiiraha iyo
sida saabuunta dharmaydhaha. 3 Oo wuxuu u fadhiyi
doonaa sida kan lacagta miira oo safeeya, oo reer Laawi
wuu daahirin doonaa, oo iyaguu u safayn doonaa sida
dahabka iyo lacagta loo safeeyo, oo iyana si xaqnimo ah
ayay Rabbiga qurbaanno ugu bixin doonaan. 4 Markaasaa
qurbaanka dadka Yahuudah iyo kan reer Yeruusaalem
noqon doona mid Rabbigu ku farxo, sidii waagii hore iyo
sidii sannadihii qadiimka ahaa. 5 Oo anigu waan idiin
soo dhowaan doonaa inaan idin xukumo aawadeed, oo
markhaati dheereeya baan ku noqon doonaa saaxiriinta,
iyo dhillayada, iyo dhaarbeenlowyada, iyo kuwa shaqaale
mushahaaradiisa ku dulma, iyo kuwa carmalka iyo agoonta
dhiba, iyo kuwa qariibka gartiisa ka qalloociya, iyo kuwa aan
iga cabsan, ayaa Rabbiga ciidammadu leeyahay. 6 Ilma
Yacquubow, anigoo Rabbiga ah isma beddelo, haddaba
sidaas daraaddeed idinku ma aydaan wada baabbi'in. 7 Tan
iyo wakhtigii awowayaashiin ayaad amarradaydii gees uga
leexanayseen, oo ma aydaan dhawraynin iyagii. Haddaba
Rabbiga ciidammadu wuxuu leeyahay, Xaggayga u soo
noqda, oo anna waan idiin soo noqon doonaa. Laakiinse
idinku waxaad tidhaahdaan, Sidee baannu u noqonaynaa?
8 Nin miyuu Rabbiga dhacaa? Idinkuse waad i dhacdaan.
Laakiinse waxaad tidhaahdaan, Maxaannu kaa dhacnay?
Waxaad iga dhacdeen meeltobnaadyo iyo qurbaanno. 9
Idinku, quruuntiinnan oo dhammu, waxaad ku inkaaran tihiin
inkaartii, waayo, waad i dhacdaan. 10 Rabbiga ciidammadu
wuxuu leeyahay, Meeltobnaadyada oo dhan khasnadda soo
geliya in gurigayga cunto ku jirto aawadeed, oo haddaba
taas igu tijaabiya, haddii aan idiin furi waayo daaqadaha
samada, oo aan idinkaga soo shubi waayo barako aan meel
qaadi karta la arag. 11 Rabbiga ciidammadu wuxuu leeyahay,
Daraaddiin baan u canaanan doonaa kan wax cuna, oo isna
midhaha dhulkiinna ma uu baabbi'in doono, oo canabkiinna
beerta ku yaallana xilligiisa ka hor midhihiisa ma xoori doono.
12 Oo Rabbiga ciidammadu wuxuu leeyahay, Quruumaha oo
dhammu waxay idiinku yeedhi doonaan, Kuwa barakaysan,
waayo, idinku waxaad ahaan doontaan dal aad u faraxsan.
13 Rabbigu wuxuu leeyahay, Erayadiinnii waxay ahaayeen
erayo adag oo iga gees ah, idinkuse waxaad tidhaahdaan,
Goormaannu wax kaa sheegnay? 14 Waxaad tidhaahdeen,
In Rabbiga loo adeego waxtar ma leh, oo bal maxaa
faa'iido ah oo noogu jira haddaannu amarkiisii dhawrnay,
iyo xataa haddaannu murugaysnaan Rabbiga ciidammada
kula hor soconnay? 15 Oo haatan waxaannu kuwa kibirka
leh ugu yeedhnaa, Kuwa barakaysan, kuwa xumaanta ka
shaqeeyaa way barwaaqoobaan; xataa Ilaah way jirrabaan,
oo haddana way samatabbaxaan. 16 Markaasaa kuwii
Rabbiga ka cabsaday midkood baa midka kale la hadlay, oo
Rabbiguna wuu dhegaystay oo wuu maqlay, oo hortiisa kitaab
xusuuseed baa loogu qoray kuwii Rabbiga ka cabsaday, iyo
kuwii magiciisa ka fiirsaday. 17 Oo Rabbiga ciidammadu
wuxuu leeyahay, Maalintii aan saas sameeyo waxay ii noqon
doonaan kuwaygii, iyo xataa khasnad khaas ah, oo waan
u tudhi doonaa sida nin ugu tudho wiilkiisa u adeega. 18
Markaasaad soo noqon doontaan oo waxaad kala garan
doontaan kan xaqa ah iyo kan sharka ah, iyo kan Ilaah u
adeega iyo kan aan isaga u adeegin.

4 Rabbiga ciidammadu wuxuu leeyahay, Bal ogaada,
maalintii waa imanaysaa oo waxay u qaxmaysaa sidii
foorno oo kale, oo kuwa kibirka leh oo dhan iyo kuwa
xumaanta ka shaqeeya oo dhammuba waxay ahaan doonaan
jirrido jajab ah, oo maalinta imanaysa ayaa iyaga gubi
doonta, taasuna iyaga uma reebi doonto xidid iyo laan
toona. 2 Laakiinse kuwiinna magacayga ka cabsada waxaa
idiin soo bixi doonta qorraxdii xaqnimada oo baallaheeda
bogsiinta ku sidda, oo intaad baxdaan ayaad u boodboodi
doontaan sida weylaha edegga ka baxa oo kale. 3 Oo
waxaad ku tuman doontaan kuwa sharka ah oo dhan,
waayo, maalinta aan saas sameeyo iyagu waxay ahaan
doonaan sida dambas cagihiinna ka hooseeya, ayaa Rabbiga
ciidammadu leeyahay. 4 Xusuusta addoonkaygii Muuse
sharcigiisii, kaasoo aan ku amray isagoo jooga Buur Xoreeb
oo aan u siiyey reer binu Israa'iil oo dhan daraaddood,
waxaana weeye qaynuunno iyo xukummo. 5 Bal eega,
maalinta weyn oo cabsida badan oo Rabbigu intaanay
iman waxaan idiin soo diri doonaa Nebi Eliiyaah. 6 Oo
isagu aabbayaasha qalbigooda ayuu u soo jeedin doonaa
carruurta xaggooda, oo carruurta qalbigoodana wuu u soo
jeedin doonaa aabbayaasha xaggooda, si aanan u iman oo
dhulka inkaar ugu dhufan.

AXDIGA CUSUB




*Markaasaa Ciise wuxuu yidhi, Aabbow, iyaga cafi, waayo, garan maayaan waxay samaynayaan. Markaasay dharkiisii qaybsadeen, wayna saami riteen.*

Luukos 23:34

# Matayos

1 Kanu waa kitaabkii abtirsiinyada Ciise Masiix, ina
Daa'uud, ina Ibraahim. 2 Ibraahim wuxuu dhalay Isxaaq,
Isxaaqna wuxuu dhalay Yacquub, Yacquubna wuxuu dhalay
Yahuudah iyo walaalihiis, 3 Yahuudahna wuxuu Tamar ka
dhalay Feres iyo Serah, Feresna wuxuu dhalay Esroom,
Esroomna wuxuu dhalay Araam, 4 Araamna wuxuu dhalay
Caminadaab, Caminadaabna wuxuu dhalay Naasoon,
Naasoonna wuxuu dhalay Salmoon, 5 Salmoonna wuxuu
Raxab ka dhalay Bocas, Bocasna wuxuu Ruud ka dhalay
Coobeed, Coobeedna wuxuu dhalay Yesay, 6 Yesayna
wuxuu dhalay boqor Daa'uud. Daa'uudna wuxuu naagtii
Uuriyaah qabi jiray ka dhalay Sulaymaan, 7 Sulaymaanna
wuxuu dhalay Rexabcaam, Rexabcaamna wuxuu dhalay
Abyaah, Abyaahna wuxuu dhalay Aasaa, 8 Aasana wuxuu
dhalay Yoosafaad, Yoosafaadna wuxuu dhalay Yooraam,
Yooraamna wuxuu dhalay Cusyaah, 9 Cusyaahna wuxuu
dhalay Yootam, Yootamna wuxuu dhalay Axaas, Axaasna
wuxuu dhalay Xisqiyaah, 10 Xisqiyaahna wuxuu dhalay
Manaseh, Manasehna wuxuu dhalay Aamoon, Aamoonna
wuxuu dhalay Yoosiyaah, 11 Yoosiyaahna wuxuu dhalay
Yekonyaah iyo walaalihiis waagii Baabuloon loo kaxeeyey. 12
Goortii Baabuloon loo kaxeeyey dabadeed, Yekonyaah wuxuu
dhalay Salaatii'eel, Salaatii'eelna wuxuu dhalay Serubaabel,
13 Serubaabelna wuxuu dhalay Abihuud, Abihuudna wuxuu
dhalay Eliyaaqiim, Eliyaaqiimna wuxuu dhalay Asoor, 14
Asoorna wuxuu dhalay Saadooq, Saadooqna wuxuu dhalay
Akhiim, Akhiimna wuxuu dhalay Eliyuud, 15 Eliyuudna wuxuu
dhalay Elecaasaar, Elecaasaarna wuxuu dhalay Mataan,
Mataanna wuxuu dhalay Yacquub, 16 Yacquubna wuxuu
dhalay Yuusuf oo ahaa ninkii Maryan, tii Ciise, kan Masiix la
yidhaahdo, ka dhashay. 17 Haddaba abtirsiinyada oo dhan oo
Ibraahim ilaa Daa'uud waa afar iyo toban oday, Daa'uud ilaa
waagii Baabuloon loo kaxeeyeyna waa afar iyo toban oday,
waagii Baabuloon loo kaxeeyey ilaa Masiixana waa afar
iyo toban oday. 18 Dhalashadii Ciise Masiix sidanay ahayd.
Kolkii hooyadiis Maryan u doonanayd Yuusuf, intaanay
isu iman, waxaa la arkay iyadoo Ruuxa Quduuskaa ka
uuraysatay. 19 Ninkeedii Yuusuf wuxuu ahaa nin xaq ah oo
aan doonayn inuu dadka tuso, wuxuuse doonayay inuu si
qarsoon u eryo. 20 Laakiin intuu waxan ka fiirsanayay ayaa
malaa'igtii Rabbigu riyo ugu muuqatay, iyadoo leh, Yuusuf ina
Daa'uudow, ha ka baqin inaad naagtaada Maryan qaadatid,
waayo, waxa ay uuraysatay ayaa Ruuxa Quduuskaa ka
yimid. 21 Oo waxay umuli doontaa wiil, magiciisana waxaad u
bixin doontaa Ciise, waayo, dadkiisa ayuu dembiyadooda ka
badbaadin doonaa. 22 Waxaas oo dhan waxay u dhaceen in
la arko wixii Rabbigu kaga dhex hadlay nebiga, isagoo leh, 23
Gabadh bikrad ah baa uuraysan doonta oo wiil umuli doonta,
Magiciisana waxaa loo bixin doonaa, Cimmaanuu'eel; kan
micnihiisu yahay, Ilaah baa inala jooga. 24 Markaasaa Yuusuf
hurdadii ka kacay oo yeelay sidii malaa'igtii Rabbigu ku
amartay, oo naagtiisii ayuu qaatay; 25 uma uuse tegin iyada
ilaa ay wiil umushay, oo wuxuu magiciisa u baxshay Ciise.

2 Goortii Ciise ku dhashay Beytlaxamtii Yahuudiya, waagii
Herodos boqorkii ahaa, waxaa Yeruusaalem bari kaga
yimid niman xigmad leh iyagoo leh, 2 Xaggee buu joogaa
boqorka Yuhuudda ee dhashay? Waayo, bari ayaannu
xiddigtiisii ka aragnay, oo waxaannu u nimid inaannu
caabudno. 3 Goortuu boqor Herodos waxan maqlay, ayuu
welwelay, isaga iyo reer Yeruusaalem oo dhan. 4 Oo intuu
isu ururiyey wadaaddadii sare iyo culimmadii dadka oo dhan,
ayuu weyddiiyey meeshii Masiixu ku dhalan lahaa. 5 Oo
waxay ku yidhaahdeen, Beytlaxamtii Yahuudiya, waayo,
sidaasaa nebigii u qoray, 6 Adigu Beytlaxam, oo dhulka
Yahuudah ahay, Kuma aad yaridba caaqillada Yahuudah
dhexdooda, Waayo, waxaa adiga kaa soo bixi doona taliye,
Kan dadkayga Israa'iil u talin doona. 7 Markaasuu Herodos
nimankii xigmadda lahaa hoos ahaan ugu yeedhay, oo
ka hubsaday goortay xiddigtu u muuqatay. 8 Kolkaasuu
Beytlaxam cid u diray oo ku yidhi, Taga oo ilmaha aad u
doondoona, oo goortaad heshaan i soo ogeysiiya si aan
anna ugu tago oo u caabudo. 9 Goortay boqorkii maqleen
ayay tageen, oo xiddigtii ay bari ka arkeen ayaa hor kacday
ilaa ay timid oo ay kor joogsatay meeshii ilmuhu joogay,
10 oo goortay xiddigtii arkeen ayay farxad aad u weyn ku
farxeen. 11 Markaasay gurigii galeen oo waxay arkeen ilmihii
iyo Maryan hooyadiis, wayna dhaceen oo caabudeen isaga,
oo intay khasnadahoodii fureen waxay isaga u dhiibeen
hadiyado dahab iyo beeyo iyo malmal ah. 12 Markaasaa riyo
loogu digay inaanay Herodos ku noqon, oo dhulkoodii ayay
jid kale u mareen. 13 Goortay ka tageen, malaa'igtii Rabbiga
ayaa Yuusuf riyo ugu muuqatay, iyadoo leh, Kac oo kaxee
ilmaha iyo hooyadiis, oo Masar u carar oo halkaas joog ilaa
aan kuu soo sheego, waayo, Herodos ayaa ilmaha dooni
doona inuu dilo. 14 Wakhti habeen ah ayuu kacay, oo ilmihii
iyo hooyadiis kaxeeyey, oo Masar tegey, 15 oo halkaasuu
joogay ilaa dhimashadii Herodos, inay noqoto wixii Rabbigu
kaga dhex hadlay nebiga, isagoo leh, Wiilkayga ayaan
Masar uga yeedhay. 16 Goortuu Herodos arkay inay nimankii
xigmadda lahaa ku cayaareen isagii, ayuu aad u cadhooday,
oo cid buu u diray oo laayay wiilashii yaryaraa oo dhan, kuwii

laba sannadood jiray iyo kuwii ka yaraa oo joogay Beytlaxam
iyo meelaha u dhow oo dhan, sida wakhtigii uu nimankii
xigmadda lahaa ka hubsaday. 17 Markaas waxaa noqotay
wixii nebi Yeremyaah lagaga dhex hadlay, isagoo leh, 18
Cod baa Raamaah laga maqlay, Oohin iyo baroor weyn,
Raaxeel oo u ooyaysa carruurteeda, Oo aan doonaynin in la
qalbi qabowjiyo, waayo, ma ay joogin. 19 Laakiin goortuu
Herodos dhintay, malaa'igtii Rabbiga ayaa riyo ugu muuqatay
Yuusuf oo Masar jooga, iyadoo leh, 20 Kac oo kaxee ilmaha
iyo hooyadiis, oo dhulka Israa'iil tag, waayo, kuwii ilmaha
naftiisa doonayay waa dhinteen. 21 Markaasuu kacay oo
kaxeeyey ilmihii iyo hooyadiis, oo dalkii Israa'iil tegey. 22
Laakiin goortuu maqlay in Arkhela'os meeshii aabbihiis
Herodos Yahuudiya xukumayo, wuu ka baqay inuu halkaas
tago. Markaase Ilaah baa riyo ugu digay, oo uu dhinacyada
Galili ku leexday. 23 Wuxuuna yimid oo degay magaalada
Naasared la odhan jiray si ay u noqoto wixii nebiyada lagaga
hadlay, Waxaa loogu yeedhayaa Naasaraani.

**3** Maalmahaas waxaa yimid Yooxanaa Baabtiisaha isagoo
cidlada Yahuudiya wax ku wacdiyaya, oo leh, 2
Toobadkeena, waayo, boqortooyadii jannadu waa dhow
dahay. 3 Waayo, kan waa kii nebi Isayos ka hadlay kolkuu
yidhi, Waa codka kan cidlada kaga qaylinaya, Jidka Rabbiga
hagaajiya, Waddooyinkiisa toosiya. 4 Yooxanaa qudhiisu
wuxuu guntanaa dharkiisii dhogorta geel ahaa, oo suun
meged ahna dhexduu ku xidhnaa, cuntadiisuna waxay ahayd
ayax iyo malab dibadeed. 5 Markaas waxaa u soo baxay
dadka Yeruusaalem, iyo kuwa Yahuudiya oo dhan iyo kuwa
dalka Urdun ku wareegsan oo dhan, 6 markaasuu Webi
Urdun ku baabtiisay iyagoo dembiyadooda qiranaya. 7
Laakiin goortuu arkay qaar badan oo Farrisiin iyo Sadukiin
ah oo baabtiiskiisa yimid wuxuu ku yidhi, Dhal jilbisay, yaa
idiinka digay inaad ka carartaan cadhada imanaysa? 8
Haddaba midho toobad istaahila soo bixiya, 9 hana ku
fikirina inaad tidhaahdaan, Waxaannu leennahay Ibraahim
oo aabbe noo ah. Waayo, waxaan idinku leeyahay, Ilaah
waa karaa inuu dhagaxyadan carruur uga kiciyo Ibraahim. 10
Haddeer weliba faaska waxaa la dhigay geedaha guntooda.
Sidaa darteed geed walba oo aan midho wanaagsan soo
bixin waa la gooyaa oo dabkaa lagu tuuraa. 11 Anigu biyo
ayaan idinku baabtiisaa ilaa toobadda, laakiin kan iga daba
imanayaa waa iga itaal weyn yahay, kan aanan istaahilin
inaan kabihiisa u qaado. Isagu wuxuu idinku baabtiisi doonaa
Ruuxa Quduuska ah iyo dab. 12 Masaftiisu gacantiisay ku
jirtaa, goobta wax lagu tumona aad buu u safayn doonaa, oo
sarreenkiisa ayuu maqsinka ku soo ururin doonaa, laakiin
buunshaha ayuu dab aan damayn ku gubi doonaa. 13
Markaasaa Ciise Galili ka yimid oo Webi Urdun ugu tegey
Yooxanaa inuu baabtiiso. 14 Yooxanaase waa diiday, isagoo
leh, Anaa u baahan inaad i baabtiisto, adiguna miyaad
ii timid? 15 Laakiin Ciise waa u jawaabay oo ku yidhi,
Haddeer oggolow, waayo, sidaas waa inoo eg tahay inaynu
xaqnimada oo dhan wada yeelno; markaasuu u oggolaaday.
16 Ciise goortii la baabtiisay, ayuu markiiba biyaha kor uga
baxay, kolkaasaa samooyinku furmeen, oo wuxuu arkay
Ruuxa Ilaah oo sida qoolley oo kale u soo degaya oo
dushiisa imanaya, 17 oo cod baa samooyinka ka lahaa,
Kanu waa Wiilkayga aan jeclahay, oo aan ku faraxsanahay.

**4** Goortaasaa Ruuxu Ciise cidlada u kaxeeyey in Ibliisku
jirrabo. 2 Oo goortuu afartan maalmood iyo afartan
habeen soomanaa, ayuu dabadeed gaajooday. 3 Markaasaa
duufiyihii u yimid oo ku yidhi, Haddaad tahay Wiilka Ilaah,
dhagaxyadan ku dheh, Kibis noqda. 4 Laakiin wuu u
jawaabay oo ku yidhi, Waa qoran tahay, Dadku waa inaanu
kibis oo keliya ku noolaan, laakiin waa inuu eray walba
oo afka Ilaah ka soo baxa ku noolaado. 5 Markaasaa
Ibliisku magaaladii quduuska ahayd geeyey, wuxuuna saaray
munaaraddii macbudka 6 oo ku yidhi, Haddaad tahay Wiilka
Ilaah, hoos isu tuur, waayo, waa qoran tahay, Malaa'igihiisa
ayuu amri doonaa, Oo gacmahooda ayay sare kuugu qaban
doonaan, Inaanay cagtaadu dhagax ku dhicin. 7 Ciise wuxuu
ku yidhi, Haddana waa qoran tahay, Rabbiga Ilaahaaga ah
waa inaanad jirrabin. 8 Haddana Ibliiskii ayaa buur aad u
dheer geeyey, wuxuuna tusay boqortooyooyinka dunida oo
dhan iyo ammaantooda. 9 Wuxuuna ku yidhi, Waxyaalahan
oo dhan waan ku siinayaa haddaad sujuuddid oo i caabuddid.
10 Markaasaa Ciise wuxuu ku yidhi, Shayddaan yahow, bax,
waayo, waa qoran tahay, Waa inaad caabuddo Rabbiga
Ilaahaaga ah oo waa inaad isaga keliya u adeegto. 11
Markaasaa Ibliiskii ka tegey, oo waxaa u yimid malaa'igo,
wayna u adeegeen. 12 Maarkuu maqlay in Yooxanaa la
qabtay, ayuu Galili ku leexday, 13 oo intuu Naasared ka
tegey, wuxuu yimid oo degay Kafarna'um, tan badda agteeda
ahayd oo ku jirtay soohdimaha Sebulun iyo Naftaali, 14
inay noqoto wixii nebi Isayos lagaga dhex hadlay, isagoo
leh, 15 Dhulka Sebulun iyo dhulka Naftaali, Xagga jidka
badda, Webi Urdun shishadiisa, Galili quruumaha ka mid
ah, 16 Dadkii fadhiyi jiray gudcurka Ayaa iftiin weyn arkay,
Kuwii fadhiyi jiray dalka iyo hooska dhimashadana, Iftiin
baa u baxay. 17 Markaas dabadeed Ciise wuxuu bilaabay
inuu wax ku wacdiyo oo yidhaahdo, Toobadkeena, waayo,
boqortooyadii jannadu waa dhow dahay. 18 Markuu badda

Galili ag marayay wuxuu arkay laba walaalo ah, Simoon
kii Butros la odhan jiray iyo Andaros oo ahaa walaalkiis,
iyagoo shabag badda ku tuuraya, waayo, waxay ahaayeen
kalluumaystayaal. 19 Oo wuxuu ku yidhi, I soo raaca, waxaan
idinka dhigayaa kuwa dadka jillaabta. 20 Markiiba intay
shabagyadii ka tageen, ayay raaceen isagii. 21 Markuu
meeshaas hore uga socday wuxuu arkay laba kale oo
walaalo ah, Yacquub ina Sebedi iyo walaalkiis Yooxanaa,
iyagoo aabbahood doonnida kula jira oo shabagyadoodii
hagaajinaya, wuuna u yeedhay. 22 Markiiba doonnidii iyo
aabbahood way ka soo tageen oo way raaceen. 23 Ciise
ayaa Galili oo dhan ku wareegay, isagoo sunagogyadooda
wax ku baraya oo injiilka boqortooyadii ku wacdiyaya oo
bukaan oo dhan iyo cudur oo dhan bogsiinaya dadka
dhexdiisa. 24 Warkiisuna waa gaadhay Suuriya oo dhan, oo
waxay u keeneen kuwii bukay oo dhan, oo cudurro kala
cayncayn ah iyo silic qabay, iyo kuwo jinni qaba, iyo kuwo
suuxdin qaba, iyo kuwa curyaan ah, wuuna bogsiiyey. 25
Waxaana raacay dad badan oo ka yimid Galili iyo Dekabolis
iyo Yeruusaalem iyo Yahuudiya iyo Webi Urdun shishadiisa.

5 Markuu dadkii badnaa arkay ayuu buur fuulay, markaasuu
fadhiistay oo xertiisa ayaa u timid. 2 Kolkaasuu afkiisa kala
qaaday oo wax baray, isagoo leh. 3 Waxaa barakaysan kuwa
xagga ruuxa ka masaakiin ah, waayo, boqortooyada jannada
iyagaa leh. 4 Waxaa barakaysan kuwa baroorta, waayo,
waa la qalbiqabowjin doonaa. 5 Waxaa barakaysan kuwa
camal qabow, waayo, dhulkay dhaxli doonaan. 6 Waxaa
barakaysan kuwa xaqnimada u gaajaysan oo u harraadsan,
waayo, way dhergi doonaan. 7 Waxaa barakaysan kuwa
naxariista leh, waayo, waa loo naxariisan doonaa. 8 Waxaa
barakaysan kuwa qalbiga ka daahirsan, waayo, Ilaah bay
arki doonaan. 9 Waxaa barakaysan kuwa nabadda ka
shaqeeyaa, waayo, waxaa loogu yeedhi doonaa wiilashii
Ilaah. 10 Waxaa barakaysan kuwa xaqnimada aawadeed loo
silciyo, waayo, boqortooyada jannada iyagaa leh. 11 Waad
barakaysan tihiin goortii laydin caayo, oo laydin silciyo, oo
wax walba oo xun oo been ah laydinka sheego aawaday. 12
Farxa oo reyreeya, waayo, jannada abaalgudkiinnu waa ku
weyn yahay, waayo, sidaasay u silcin jireen nebiyadii idinka
horreeyey. 13 Idinku waxaad tihiin cusbadii dhulka, laakiin
haddii cusbadu dhadhan beesho, maxaa lagu cusbaynayaa?
Dabadeed waxba tari mayso in dibadda loo tuuro oo dadku
ku tunto maahee. 14 Idinku waxaad tihiin iftiinkii dunida.
Magaalo buur ku taallu ma qarsoomi karto. 15 Ilays looma
shido in la hoos geliyo weel, laakiin waxaa la saaraa meeshii
ilayska, oo wuu u iftiimaa kuwa guriga ku jira oo dhan. 16
Sidaas oo kale iftiinkiinnu dadka hortiisa ha iftiimo, si ay
shuqulladiinna wanaagsan u arkaan, oo ay Aabbihiinna
jannada ku jira u ammaanaan. 17 Ha u malaynina inaan
u imid inaan sharciga ama qorniintii nebiyada baabbi'iyo;
uma aan iman inaan baabbi'iyo, laakiin waxaan u imid
inaan wada oofiyo 18 Runtii waxaan idinku leeyahay, Intaan
cirka iyo dhulku idlaan, xaraf ama dhibic keliya ka idlaan
mayso sharciga ilaa ay wada noqdaan. 19 Sidaa darteed
kii jebiya qaynuunnadan kuwa ugu yar midkood, oo sidaas
dadka u bara, waxaa loogu yeedhi doonaa kan uga yar
boqortooyadii jannada, laakiin kii yeela oo bara, waxaa
loogu yeedhi doonaa kan weyn boqortooyadii jannada. 20
Waayo, waxaan idinku leeyahay, Xaqnimadiinnu haddaanay
ka badnaan tan culimmada iyo Farrisiinta, geliba maysaan
boqortooyadii jannada. 21 Waad maqasheen in kuwii hore
lagu yidhi, Waa inaanad dhiig qabin; kii dhiig qabaa wuxuu
galabsadaa xukunka. 22 Laakiin waxaan idinku leeyahay,
Mid walba oo walaalkiis u cadhoodaa wuxuu galabsadaa
xukunka, oo kii walaalkiis ku yidhaahda, Nacas yahow,
wuxuu galabsadaa in shirka la geeyo, oo kii yidhaahda,
Doqon yahow, wuxuu galabsadaa jahannamada dabka
ah. **(Geenna g1067)** 23 Haddaba haddaad hadiyaddaada
meesha allabariga keento, oo meeshaas aad ku xusuusatid
in walaalkaa wax kuu haysto, 24 hadiyaddaada ku dhaaf
meeshii allabariga horteeda, tag, oo horta walaalkaa la
soo heshii, dabadeed kaalay oo hadiyaddaada bixi. 25
Dhaqso cadowgaaga ula heshii intaad jidka kula socoto, si
aan cadowgu xaakinka kuugu dhiibin, xaakinkuna askariga
kuugu dhiibin, oo xabsi lagugu tuurin. 26 Runtii waxaan
kugu leeyahay, Halkaas ka soo bixi maysid ilaa aad siisid
beesadda ugu dambaysa. 27 Waad maqasheen in la yidhi,
Waa inaanad sinaysan. 28 Laakiin waxaan idinku leeyahay,
Nin walba oo qof dumar ah damac u eegaa, durba qalbigiisuu
kaga sinaystay. 29 Haddii ishaada midig ku xumayso, iska bixi
oo iska tuur, waayo, waxaa kuu wanaagsan in xubnahaaga
mid kaa lunto intii jidhkaaga oo dhan jahannamada lagu
tuuri lahaa. **(Geenna g1067)** 30 Gacantaada midig hadday
ku xumayso, iska jar oo iska tuur, waayo, waxaa kuu
wanaagsan in xubnahaaga mid kaa lunto intii jidhkaaga oo
dhan jahannamada geli lahaa. **(Geenna g1067)** 31 Waxaana
la yidhi, Ku alla kii naagtiisa furaa, warqaddii furniinka ha
siiyo. 32 Laakiin waxaan idinku leeyahay, Mid walba oo
naagtiisa furaa sababta sinada aawadeed maahee, wuxuu ka
dhigayaa inay sinaysato, oo kii guursadaa tii la furayna waa
sinaystaa. 33 Weliba waad maqasheen in kuwii hore lagu
yidhi, Waa inaanad nidarradaada jebin, laakiin waa inaad
Rabbiga u yeeshaa nidarradaada. 34 Laakiin waxaan idinku

leeyahay, Ha dhaaraninaba; jannada ha ku dhaaranina,
waayo, waa carshigii Ilaah. 35 Dhulkana ha ku dhaaranina,
waayo, waa meeshuu cagihiisa dhigo; Yeruusaalemna ha
ku dhaaranina, waayo, waa magaaladii Boqorkii weynaa.
36 Madaxaagana ha ku dhaaran, waayo, tin keliya kama
dhigi kartid caddaan ama madow. 37 Laakiin hadalkiinnu ha
ahaado, Haah, haah, maya, maya; wixii intaas ka badan
sharkuu ka yimaadaa. 38 Waad maqasheen in la yidhi,
Il il ha loo rido, iligna ilig ha loo rido. 39 Laakiin waxaan
idinku leeyahay, Sharka ha hor istaagina, laakiin ku alla kii
dhabanka midig kaa dharbaaxa, kan kalena u jeedi, 40 oo kii
doonaya inuu ku ashtakeeyo oo khamiiskaaga kaa qaato,
maradaadana u daa, 41 oo ku alla kii kugu qasba inaad
mayl la socotid, laba la soco. 42 Kii wax kaa barya, sii, oo kii
doonaya inuu wax kaa amaahdo ha ka sii jeesan. 43 Waad
maqasheen in la yidhi, Waa inaad deriskaaga jeclaatid oo
cadowgaaga necbaatid, 44 laakiin waxaan idinku leeyahay,
Cadowyadiinna jeclaada, u duceeya kuwa idin habaara,
wax wanaagsan u sameeya kuwa idin neceb, oo Ilaah u
barya kuwa idin caaya oo idin silciya, 45 si aad u ahaataan
wiilashii Aabbihiinna jannada ku jira, waayo, qorraxdiisa
wuxuu u soo bixiya kuwa xun iyo kuwa wanaagsan, roobna
wuu u di'iyaa kuwa xaqa ah iyo kuwa aan xaqa ahaynba.
46 Waayo, haddaad jeceshihiin kuwa idin jecel, abaalkee
baad leedihiin? Cashuurqaadayaashu miyaanay sidaas
oo kale samayn? 47 Haddaad salaantaan walaalihiin oo
keliya, maxaa dheeraad ah oo aad samaysaan? Dadka kale
miyaanay sidaas oo kale samayn? 48 Saas aawadeed u
samaada sida Aabbihiinna jannadu u san yahay.

6 Iska jira inaydnaan xaqnimadiinna dadka ku hor samayn
inay idin arkaan, haddii kale abaal kuma lihidin Aabbihiinna
jannada ku jira. 2 Haddaba markaad sadaqad bixinayso, buun
ha ugu dhufan hortaada sida labawejiilayaashu sunagogyada
iyo jidadka ku sameeyaan si dadku u ammaanaan. Runtii
waxaan idinku leeyahay, Abaalgudkoodii way heleen. 3
Laakiin adigu goortaad sadaqad bixinayso, bidixdaadu
yaanay ogaan waxa midigtaadu samaynayso, 4 si ay
sadaqaddaadu u qarsoonaato, oo Aabbahaaga waxa qarsoon
arka ayaa kuu abaalgudi doona. 5 Oo goortaad tukanaysaan,
ha ahaanina sida labawejiilayaasha, waayo, waxay jecel
yihiin inay tukadaan iyagoo taagan sunagogyada iyo meesha
jidadku isku gooyaan si ay dadka ugu muuqdaan. Runtii
waxaan idinku leeyahay, Abaalgudkoodii way heleen. 6
Laakiin adigu goortaad tukanaysid, qolkaaga qarsoon gal,
oo goortaad albaabkaaga xidhid, Aabbahaaga meesha
qarsoon ku jira bari, oo Aabbahaaga waxa qarsoon arka
ayaa kuu abaalgudi doona. 7 Goortaad tukanaysaan
hadalka ha ku celcelinina sida dadka aan Ilaah aaminin
yeelaan, waayo, waxay u malaynayaan in loo maqlayo
hadalkooda badan aawadiis. 8 Sidaa darteed ha ahaanina
sidooda oo kale, waayo, Aabbihiin waa og yahay waxaad
u baahan tihiin intaanad weyddiin. 9 Haddaba sidatan
u tukada, Aabbahayaga jannada ku jirow, magacaagu
quduus ha ahaado. 10 Boqortooyadaadu ha timaado,
doonistaada dhulka ha lagu yeelo sida jannada loogu
yeelo. 11 Kibis maalin nagu filan, maanta na sii. 12 Oo
naga cafi qaamahayaga sidaannu u cafinnay kuwa noo
qaamaysan. 13 Oo jirrabaadda ha noo kaxayn, laakiin
sharka naga du. Waayo, boqortooyada iyo xoogga iyo
ammaanta adigaa leh weligaa. Aamiin. 14 Waayo, haddaad
dadka u cafidaan xumaantooda, Aabbihiinna jannada ku
jira ayaa idin cafiyi doona. 15 Laakiin haddaanad dadka
cafiyin, Aabbihiinnu xumaantiinna idiin cafiyi maayo. 16
Kolkaad soontaan ha ahaanina sida labawejiilayaashu u
fool qulubsan yihiin, waayo, way isfoolxumeeyaan si ay
dadka ugu muuqdaan inay sooman yihiin. Runtii waxaan
idinku leeyahay, Abaalgudkoodii way heleen. 17 Laakiin
adigu goortaad soontid, madaxaaga saliid marso oo fool
dhaqo, 18 si aadan dadka ugu muuqan inaad sooman tahay,
laakiin aad ugu muuqatid Aabbahaaga meel qarsoon ku jira,
oo Aabbahaaga waxa qarsoon arkaa waa kuu abaalgudi
doonaa. 19 Maal ha ku urursanina dhulka, meesha aboorka
iyo miridhku ku baabbi'iyaan, iyo meesha tuugaggu jebiyaan
oo ka xadaan, 20 laakiin maal jannada ku urursada, meesha
aboorka iyo miridhku ayan ku baabbi'in iyo meesha tuugaggu
ayan jebin oo ayan ka xadin. 21 Waayo, meesha maalkaagu
ku jiro, meeshaasaa qalbigaaguna ku jiri doonaa. 22 Ilayska
jidhku waa isha; haddaba haddii ishaadu hagaagsan tahay,
jidhkaaga oo dhammi waa iftiimi doonaa. 23 Laakiin ishaadu
hadday xun tahay, jidhkaaga oo dhammi gudcur buu ahaan
doonaa. Haddaba iftiinka kugu jira hadduu gudcur yahay,
gudcurkaasu sidee buu u weyn yahay! 24 Ninna laba sayid
uma shaqayn karo, waayo, mid buu nacayaa, kan kalena
wuu jeclaanayaa, ama mid buu la jirayaa, kan kalena wuu
quudhsanayaa. Uma wada shaqayn kartaan Ilaah iyo maal.
25 Sidaa darteed waxaan idinku leeyahay, Ha ugu welwelina
naftiinna waxaad cuni doontaan, iyo waxaad cabbi doontaan,
jidhkiinnana ha ugu welwelina waxaad u huwan doontaan.
Naftu miyaanay ka roonayn cuntada, jidhkuna miyaanu ka
roonayn dharka? 26 Shimbirraha cirka eega, waayo, waxba
ma beeraan, waxna ma gurtaan, maqsinnona waxba kuma
urursadaan, oo Aabbihiinna jannada ku jira ayaa cunto
siiya. Idinku miyaydnaan ka roonayn? 27 Midkiinnee intuu

welwelo dhererkiisa dhudhun ku dari kara? 28 Maxaad
dharka ugu welweshaan? Fiiriya ubaxyada duurka siday
u baxaan, ma ay shaqeeyaan, ma ayna miiqdaan. 29
Weliba waxaan idinku leeyahay, Xataa Sulaymaan wakhtigii
ammaantiisa oo dhan dhar uma uu gashan jirin sida kuwan
midkood. 30 Laakiin haddii Ilaah sidaa u huwiyo cawska
maanta duurka ku yaal oo berrito moofada lagu ridayo,
sidee ka badan ayuu idiin huwinayaa, rumaysadyarayaalow?
31 Sidaa darteed ha ku welwelina, idinkoo leh, Maxaannu
cunaynaa? ama, Maxaannu cabbaynaa? ama, Maxaannu
huwanaynaa? 32 Waayo, quruumuhu waxaas oo dhan ayay
doondoonaan. Aabbihiinna jannada ku jiraa waa og yahay
inaad waxaas oo dhan u baahan tihiin. 33 Laakiin horta
doondoona boqortooyadii Ilaah iyo xaqnimadiisa, oo waxaas
oo dhan waa laydinku dari doonaa. 34 Sidaa darteed berrito
ha ka welwelina, waayo, berrito iyadaa isu welwelaysa.
Maalinta sharkeedu waa ku filan yahay.

7 Ninna ha xukumina inaan laydin xukumin. 2 Waayo,
xukunkii aad ku xukuntaan ayaa laydinku xukumi doonaa,
oo qiyaastii aad ku qiyaastaan ayaa laydinku qiyaasi doonaa.
3 Saxarka isha walaalkaa ku jira maxaad u aragtaa, dogobka
ishaada ku jirase aad u fiirsan weydaa? 4 Sidee baad
walaalkaa ugu odhan doontaa, I daa, saxarka ishaada
ku jira aan kaa saaree; oo dogob baa ishaada ku jiree?
5 Labawejiile yahow, horta dogobka ishaada ku jira iska
saar, goortaasaad bayaan u arkaysaa inaad saxarka isha
walaalkaa ku jira ka saarto. 6 Waxa quduuska ah eeyaha ha
siinina, luulkiinnana doofaarrada hortooda ha ku tuurina,
si ayan ugu tuman oo ayan idinku soo jeesan oo ayan
idiinkala jeexjeexin. 7 Weyddiista oo waa laydin siin doonaa;
doona oo waad heli doontaan: garaaca oo waa laydinka furi
doonaa; 8 waayo, mid kasto oo weyddiista waa la siiyaa, kii
doonaana waa helaa, kii garaacana waa laga furi doonaa.
9 Ninkiinnee baa haddii wiilkiisu kibis weyddiisto, dhagax
siinaya? 10 Ama hadduu kalluun weyddiisto, abeeso siinaya?
11 Haddaba idinka oo shar leh haddaad garanaysaan inaad
hadiyado wanaagsan carruurtiinna siisaan, intee ka badan
ayaa Aabbihiinna jannada ku jiraa wax wanaagsan uu
siin doonaa kuwa isaga weyddiista? 12 Haddaba wax
kasta oo aad doonaysaan in laydinku sameeyo, idinkuna
sidaas oo kale u sameeya; waayo, kanu waa sharcigii
iyo nebiyadii. 13 Iridda cidhiidhsan ka gala, waayo, iriddu
waa weyn tahay, jidkuna waa ballaadhan yahay kan xagga
baabbi'idda u kaca, oo kuwa ka galaa waa badan yihiin.
14 Waayo, iriddu waa cidhiidhsan tahay, jidkuna waa yar
yahay kan xagga nolosha u kaca, kuwa helaana waa yar
yihiin. 15 Iska jira nebiyada beenta ah, kuwa idiinku imanaya
iyagoo qaba dharka idaad, laakiin hoosta ka ah yeey wax
boobaysa. 16 Midhahooda ayaad ku garan doontaan. Canab
ma laga guraa geed qodxan leh? Berdena ma laga guraa
yamaarugga? 17 Sidaasaa geed kasta oo wanaagsanu
midho wanaagsan u dhalaa, geedkii xumina midho xun u
dhalaa. 18 Geed wanaagsanu midho xun ma dhali karo,
geed xumina midho wanaagsan ma dhali karo. 19 Geed
kasta oo aan midho wanaagsan dhalin waa la jaraa oo
dabka lagu tuuraa. 20 Sidaa darteed waxaad iyaga ku
garanaysaan midhahooda. 21 Ma aha qof kasta oo igu
yidhaahda, Rabbow, Rabbow, kuwa boqortooyadii jannada
gelayaa, laakiin kii sameeya doonista Aabbahayga jannada
ku jira, kaasaa gelaya. 22 Maalintaas qaar badan baa igu
odhan doona, Rabbow, Rabbow, miyaannan magacaaga
wax ku sii sheegin, oo miyaannan magacaaga jinniyo ku
saarin, oo miyaannan magacaaga wax badan oo xoog leh ku
samayn? 23 Markaasaan ku odhan doonaa, Weligay idinma
aqoon, iga taga, dembifalayaalow. 24 Haddaba qof kasta oo
ereyadaydan maqla oo yeela, waxaa loo ekaysiinayaa nin
caqli leh oo gurigiisa ka dul dhisay dhagaxa. 25 Roobkii ayaa
da'ay, daadkiina waa yimid, dabayshiina waa dhacday, wayna
ku dhaceen gurigaas, ma uuna dumin, waayo, waxaa laga
dul dhisay dhagaxa. 26 Qof kasta oo ereyadaydan maqla oo
aan yeelin, waxaa loo ekaysiinayaa nin doqon ah oo gurigiisa
carrada ka dul dhisay. 27 Roobkii waa da'ay, daadkiina
waa yimid, dabayshiina waa dhacday, wayna ku dhaceen
gurigaas, wuuna dumay, dumiddiisuna waa weynayd. 28
Waxaa dhacay goortii Ciise hadalladan dhammeeyey, in
dadkii oo dhammu waxbariddiisa la yaabeen, 29 waayo,
wuxuu wax u barayay sida mid amar leh oo uma uu baraynin
sida culimmada.

8 Goortuu buurta ka soo degay, dad badan baa soo raacay.
2 Oo bal eeg, waxaa u yimid nin baras leh oo caabuday,
oo ku yidhi, Sayidow, haddaad doonaysid, waad i daahirin
kartaa. 3 Ciise intuu gacantiisa soo taagay, ayuu taabtay,
oo ku yidhi, Waan doonayaa ee daahirsanow. Kolkiiba
baraskiisa wuu ka daahirsanaaday, 4 oo Ciise ayaa ku
yidhi, Iska eeg, oo ninna ha u sheegin, laakiin jidkaaga iska
mar, oo wadaadka istus, oo bixi hadiyaddii Muuse amray,
marag iyaga ha u ahaatee. 5 Goortuu Kafarna'um galay,
waxaa u yimid boqol-u-taliye, isagoo baryaya 6 oo leh,
Sayidow, midiidinkaygii guriguu jiifaa, isagoo curyaannimo u
buka oo aad u xanuunsanaya. 7 Kolkaasuu Ciise wuxuu
ku yidhi, Waan imanayaa oo bogsiinayaa. 8 Markaasaa
boqol-u-taliyihii u jawaabay oo ku yidhi, Sayidow, anigu ma

istaahilo inaad saqafka gurigayga hoostiisa soo gashid,
laakiin hadal keliya dheh, midiidinkayguna waa bogsan
doonaa. 9 Waayo, anigu waxaan ahay nin laga sarreeyo
oo askar baa iga hoosaysa. Kan waxaan ku idhaahdaa,
Tag, wuuna tagaa; mid kalena, Kaalay, wuuna yimaadaa;
midiidinkaygana, Waxan samee, wuuna sameeyaa. 10
Goortuu Ciise taas maqlay, wuu ka yaabay, wuxuuna ku yidhi
kuwii la socday, Runtii waxaan idinku leeyahay, Rumaysad
sidan u weyn oo kale reer binu Israa'iil kama dhex helin.
11 Waxaan idinku leeyahay, Qaar badan ayaa bari iyo
galbeed ka iman doona oo la fadhiisan doona Ibraahim
iyo Isxaaq iyo Yacquub boqortooyadii jannada gudaheeda,
12 laakiin wiilashii boqortooyada waxaa lagu tuuri doonaa
gudcurka dibadda ah. Meeshaas waxaa jiri doonta baroor
iyo ilkojirriqsi. 13 Markaasaa Ciise wuxuu boqol-u-taliyihii
ku yidhi, Tag. Sidaad u ramaysatay ha kuu noqoto e. Oo
saacaddaas ayaa midiidinkii bogsaday. 14 Ciise goortuu
guriga Butros galay, wuxuu arkay Butros soddohdiis oo
jiifta oo qandhaysan. 15 Markaasuu gacanteeda taabtay,
qandhadiina waa ka baxday. Wayna kacday oo u adeegtay
isaga. 16 Goortii makhribkii la gaadhay waxay u keeneen
qaar badan oo jinniyo qaba. Eray ayuu jinniyadii ku saaray,
kuwii bukay oo dhanna wuu bogsiiyey, 17 si ay u noqoto
wixii nebi Isayos lagaga dhex hadlay isagoo leh, Isagaa
qaatay bukaankeennii, cudurradeenniina wuu isku raray.
18 Goortuu Ciise dad badan oo ku wareegsan arkay, ayuu
amray inay dhinaca kale tagaan. 19 Kolkaasaa culimmada
midkood u yimid oo ku yidhi, Macallimow, waan ku raacayaa
meeshaad tagtidba. 20 Ciise ayaa ku yidhi, Dawacooyinku
godad bay leeyihiin, shimbirraha cirkuna buulal bay leeyihiin,
laakiin Wiilka Aadanahu meel uu madaxiisa dhigo ma leh.
21 Mid kale oo xertiisa ah ayaa ku yidhi, Sayidow, horta ii
oggolow inaan tago oo aabbahay soo aaso. 22 Laakiin Ciise
ayaa ku yidhi, I soo raac; oo iska daa meydadku ha aaseen
meydadkooda. 23 Goortuu doonnida fuulay, xertiisii ayaa
raacday. 24 Oo waxaa badda ka kacay duufaan weyn, ilaa
ay hirarku qariyeen doonnida, laakiin isagu waa hurday. 25
Markaasaa xertiisii u timid oo toosisay, iyagoo leh, Sayidow,
na badbaadi, waannu lumaynaaye. 26 Kolkaasuu wuxuu
ku yidhi, Maxaad u baqaysaan, rumaysadyarayaalow?
Markaasuu kacay, oo canaantay dabaysha iyo badda, oo
xawaal weyn baa dhacday. 27 Haddaba nimankii waa
yaabeen, oo waxay isku yidhaahdeen, Waa nin caynkee
ah kan xataa dabaysha iyo badduba yeelaan? 28 Goortuu
yimid dhinaca kale oo dalka Gadareni, waxaa la kulmay
laba qof oo jinni qaba oo xabaalaha ka soo baxaya, iyagoo
aad khatar u ah, si aan ninna jidkaas u mari karin. 29 Way
qayliyeen iyagoo leh, Maxaa inoo dhexeeya, Wiilka Ilaahow?
Ma waxaad halkan u timid inaad wakhtiga hortiis na silciso?
30 Waxaa iyaga ka fogaa daaqsin doofaarro badan ah oo
daaqaysa. 31 Jinniyadii ayaa baryay iyagoo leh, Haddaad na
saaraysid, noo dir daaqsinta doofaarrada ah, 32 oo wuxuu
ku yidhi, Baxa. Markaasay baxeen oo galeen doofaarradii,
oo daaqsinta oo dhammu jarka hoos bay uga yaacday ilaa
badda, oo biyaha ku bakhtiday. 33 Kolkaasay kuwii daajin
jiray carareen oo magaalada galeen, wax walbana way u
sheegeen iyo wixii ku dhacay kuwii jinniyada qabi jiray. 34
Markaasaa magaaladii oo dhan lagaga soo baxay inay Ciise
ka hor tagaan. Goortay arkeen, waxay ka baryeen inuu
soohdintooda ka noqdo.

**9** Markaasuu doonni fuulay oo dhanka kale u tallaabay oo
magaaladiisii yimid. 2 Kolkaasay waxay u keeneen nin
curyaan ah oo sariir ku jiifa. Ciise oo rumaysadkooda arka
ayaa ninkii curyaanka ahaa ku yidhi, Wiilkow, kalsoonow,
dembiyadaadu waa kaa cafiyan yihiin. 3 Kolkaasaa qaar
culimmada ah waxay isku yidhaahdeen, Ninkan waa
caytamayaa. 4 Ciise oo fikirradooda garanaya ayaa ku
yidhi, Maxaad haddaba shar ugu fikiraysaan qalbiyadiinna?
5 Iyamaa hawl yar, in la yidhaahdo, Dembiyadaadu waa
cafiyan yihiin, ama in la yidhaahdo, Kac oo soco? 6
Laakiin si aad ku garataan in Wiilka Aadanahu dhulka ku
leeyahay amar uu dembiyada ku cafiyo (markaasuu kii
curyaanka ahaa ku yidhi), Kac oo sariirtaada qaado oo
gurigaaga tag. 7 Markaasuu kacay oo gurigiisii tegey. 8
Laakiin dadkii badnaa goortay arkeen, way baqeen, oo
Ilaah ammaaneen, kan amar caynkan oo kale ah dadka
siiyey. 9 Ciise kolkuu meeshaas ka tegey intuu socday
ayuu wuxuu arkay nin la odhan jiray Matayos oo fadhiya
meeshii cashuurta lagu qaado, oo wuxuu ku yidhi, I soo
raac. Markaasuu kacay oo raacay. 10 Waxaa dhacay, goortii
Ciise guriga cunto u fadhiistay, in cashuurqaadayaal iyo
dembilayaal badanu yimaadeen, oo ay la fadhiisteen Ciise
iyo xertiisa. 11 Goortii Farrisiintu arkeen ayay xertiisii ku
yidhaahdeen, Macallinkiinnu muxuu cashuurqaadayaasha
iyo dembilayaasha ula cunaa? 12 Laakiin goortuu maqlay,
wuxuu yidhi, Kuwa ladan dhakhtar uma baahna, laakiin
kuwa buka ayaa u baahan. 13 Laakiin taga oo barta
hadalkan micnihiisa, Waxaan doonayaa naxariis ee ma
aha allabari, waayo uma aan imanin inaan kuwa xaqa ah
u yeedho, laakiin inaan dembilayaasha u yeedho ayaan
u imid. 14 Markaas waxaa u timid xertii Yooxanaa iyagoo
leh, Annaga iyo Farrisiintu maxaannu dhaaxa u soonnaa,
laakiin xertaadu ay u soomi weydaa? 15 Markaasaa Ciise ku

yidhi, Dadka aroosku ma barooran karaan intuu aroosku
la joogo? Laakiin waxaa iman doona maalmaha arooska
laga qaadi doono, markaasay soomi doonaan. 16 Ninna
karriin cusub kuma tolo dhar duug ah, waayo, tan lagu
buuxin lahaa ayaa dharka ka go'da, oo jeexdintu waa ka
sii xumaataa. 17 Khamri cusubna laguma shubo qarbeddo
duug ah, haddii kale qarbeddada ayaa qarxaya, khamriguna
waa daadanayaa, qarbeddaduna waa hallaabayaan, laakiin
khamri cusubse waxaa lagu shubaa qarbeddo cuscusub,
labaduba waa sii raagayaan. 18 Intuu waxan kula hadlayay,
waxaa u yimid taliye oo u sujuuday oo ku yidhi, Gabadhaydu
haddeer bay dhimatay, laakiin kaalay oo gacantaada saar
oo way noolaanaysaa. 19 Markaasaa Ciise kacay oo
raacay, isaga iyo xertiisiiba. 20 Kolkaas naag laba iyo toban
sannadood dhiigbixid qabtay ayaa dhabarkiisa timid oo
taabatay maradiisa darafteeda. 21 Waayo, waxay isku tidhi,
Haddaan maradiisa iska taabto uun, waan bogsanayaa. 22
Laakiin Ciise intuu ku soo jeestay oo arkay, ayuu wuxuu
ku yidhi, Gabadhay, kalsoonow; rumaysadkaaga ayaa ku
bogsiiyey. Oo naagtii baa saacaddaas bogsatay. 23 Ciise
goortuu guriga taliyaha galay oo arkay kuwa biibiilayaasha
yeedhinaya iyo dadka buuqaya, 24 wuxuu ku yidhi, Ka
leexda, yartu ma dhiman, waase huruddaa. Wayna ku
qosleen. 25 Laakiin markii dadkii badnaa la saaray, ayuu
galay oo gacanteeda qabtay, yartiina waa kacday. 26
Markaasaa warkaasu dalkaas oo dhan gaadhay. 27 Ciise
intuu meeshaas ka tegayay, waxaa daba socday laba
nin oo Indhala', iyagoo qaylinaya oo leh, Ina Daa'uudow,
noo naxariiso. 28 Goortuu guriga galay ayay nimankii
indhaha la'aa u yimaadeen. Markaasaa Ciise wuxuu ku
yidhi, Ma rumaysan tihiin inaan waxan yeeli karo? Waxay ku
yidhaahdeen, Haah, Sayidow. 29 Markaasuu indhahooda
taabtay isagoo leh, Sida rumaysadkiinnu yahay ha idiin
noqoto. 30 Markaasaa indhahoodii furmeen. Ciise aad buu u
amray, oo ku yidhi, Iska jira; ninna yaanu ogaan. 31 Laakiin
iyagu way baxeen oo warkiisa ku fidiyeen dhulkaas oo dhan.
32 Kolkay baxeen, bal eeg, waxaa loo keenay nin Carrabla'
oo jinni qaba. 33 Oo goortii jinnigii la saaray, ninkii carrabka
la'aa waa hadlay, dadkii badnaana way yaabeen oo waxay
yidhaahdeen, Sidaas oo kale Israa'iil weligeed laguma arag.
34 Laakiin Farrisiintii waxay yidhaahdeen, Wuxuu jinniyada
ku eryaa madaxda jinniyada. 35 Ciise wuxuu ku wareegay
magaalooyinka iyo tuulooyinka oo dhan, oo sunagogyadooda
ayuu wax ku barayay, oo injiilka boqortooyadii ku wacdiyeyey,
oo bugto walba iyo cudur walba ayuu bogsiinayay: 36 Laakiin
goortuu dadkii badnaa arkay ayuu u naxariistay, waayo, way
dhibaataysnaayeen oo kala firidhsanaayeen sidii ido aan
adhijir lahayn. 37 Markaasuu xertiisii ku yidhi, Waxa beerta
laga gooynayaa way badan yihiin, shaqaalayaashuse waa
yar yihiin. 38 Sidaa darteed Sayidka beergooyska barya inuu
shaqaalayaal beertiisa u soo diro.

**10** Markaasuu wuxuu u yeedhay laba-iyo-tobankii xertiisa
ahaa oo wuxuu siiyey amar ay jinniyo wasakh leh ku
saaraan oo ay bugto walba iyo cudur walba ku bogsiiyaan. 2
Laba-iyo-tobanka rasuul magacyadoodu waa kuwan, Kan
ugu horreeyaa waa Simoon, kan Butros la odhan jiray, iyo
walaalkiis Andaros, iyo Yacquub ina Sebedi, iyo walaalkiis
Yooxanaa, 3 iyo Filibos, iyo Bartolomayos, iyo Toomas, iyo
Matayos oo cashuurqaadaha ahaa, iyo Yacquub ina Alfayos,
iyo Tadayos, 4 iyo Simoon reer Kaana, iyo Yuudas Iskariyod,
kii gacangeliyey. 5 Laba-iyo-tobankan Ciise ayaa diray oo
amray isagoo leh, Jid ka mid ah jidadka dadka aan Yuhuudda
ahayn ha marina, magaalo ka mid ah magaalooyinka reer
Samaariyana ha gelina, 6 laakiin waxaad u tagtaan idaha
lunsan oo guriga Israa'iil ah. 7 Oo intaad socotaan wacdiya,
oo waxaad ku tidhaahdaan, Boqortooyadii jannadu waa
dhow dahay. 8 Kuwa bukana bogsiiya, kuwii dhintayna sara
kiciya, kuwa baraska lehna nadiifiya, jinniyadana saara,
hadiyad ahaan baad ku hesheen ee hadiyad ahaanna ku
siiya. 9 Dahab ama lacag ama naxaas kiishadihiinna ha
ku haysanina, 10 qandina jidka ha u qaadanina, ama laba
khamiis, ama kabo, ama ul, waayo, shaqaaluhu cuntadiisa
ayuu istaahilaa. 11 Magaalo alla magaaladaad gashaan iyo
tuuloba, ka doona mid istaahila, oo halkaas jooga ilaa aad ka
tegaysaan. 12 Goortaad guriga gelaysaan, nabdaadiya, 13 oo
hadduu gurigu istaahilo, nabaddiinnu ha ku soo degto, laakiin
haddaanu istaahilin, nabaddiinnu ha idinku soo noqoto. 14
Oo ku alla kii aan idin soo dhowayn, oo aan hadalladiinna
maqlin, goortaad gurigaas ama magaaladaas ka baxaysaan,
siigada cagihiinna ka dhabaandhaba. 15 Runtii waxaan
idinku leeyahay, Maalinta xisaabta, Sodom iyo Gomora waa
ka xisaab fududaan doonaan magaaladaas. 16 Waxaan idiin
dirayaa sidii ido yeey ku dhex jira, sidaa darteed caqli u
lahaada sida abeesooyin, oo u sir la'aada sida qoolleyo.
17 Laakiin dad iska jira, waayo, waxay idiin dhiibi doonaan
shirar, oo sunagogyadooda ayay idinku karbaashi doonaan.
18 Oo waxaa aawaday laydiin hor geeyn doonaa taliyayaal
iyo boqorro inay marag ku noqoto iyaga iyo dadka aan
Yuhuudda ahayn. 19 Laakiin goortay idin gacangeliyaan,
ha ka welwelina sidaad u hadli doontaan ama waxaad ku
hadli doontaan, waayo, waxaad ku hadli doontaan ayaa
saacaddaas laydin siin doonaa. 20 Waayo, ma aha idinka
kuwa hadlayaa laakiin waa Ruuxa Aabbihiin kan idinka dhex

hadlayaa. 21 Walaalba walaalkiis wuxuu u dhiibi doonaa in
la dilo, aabbena wiilkiisa, carruurna waalidkood ayay ku kici
doonaan oo dhimashay gaadhsiin doonaan. 22 Dadka oo
dhan ayaa magacayga aawadiis idiin necbaan doona, laakiin
kan ilaa ugu dambaysta adkaysta, kaasaa badbaadi doona.
23 Laakiin goortay magaaladan idinku silciyaan, tan kale u
carara, waayo, runtii waxaan idinku leeyahay, Magaalooyinka
Israa'iil ma wada gaadhi doontaan ilaa Wiilka Aadanahu
yimaado. 24 Qof xer ahu macallinkiisa kama sarreeyo,
addoonkuna sayidkiisa kama sarreeyo. 25 Waa ku filan
tahay qof xer ah inuu noqdo sida macallinkiisa, addoonkuna
sida sayidkiisa. Hadday odayga reerka Be'elsebul ugu
yeedhaan, intee ka badan ayay ugu yeedhi doonaan kuwa
gurigiisa jooga. 26 Sidaa darteed ha ka baqina, waayo, wax
daboolan ma jiro oo aan soo muuqan doonin, wax qarsoonna
ma jiro oo aan la garan doonin. 27 Waxaan gudcurka
idiinku sheego, iftiinka ku dhaha, oo waxaad dhegta ka
maqashaanna, guryaha dushooda kaga dhawaaqa. 28 Ha
ka baqina kuwa jidhka dila, laakiin aan karin inay nafta
dilaan, waxaadse ka baqdaan kan jahannamada ku hallayn
kara nafta iyo jidhkaba. **(Geenna g1067)** 29 Laba shimbirrood
miyaan beesad lagu iibin? Middoodna dhulka ku dhici mayso
amarka Aabbihiin la'aantiis. 30 Timaha madaxiinna oo dhan
waa tirsan yihiin. 31 Sidaa darteed ha baqina, waad ka qiima
badan tihiin shimbirro badan. 32 Sidaa darteed mid walba
oo igu qirta dadka hortiisa, anna waan ku qiran doonaa
Aabbahayga jannada ku jira hortiisa. 33 Laakiin ku alla kii igu
diida dadka hortiisa, anna waan ku diidi doonaa Aabbahayga
jannada ku jira hortiisa. 34 Ha u malaynina inaan u imid
inaan nabad dhulka u keeno; uma aan iman inaan nabad
keeno, laakiin inaan seef keeno. 35 Waxaanse u imid inaan
nin cadow kaga dhigo aabbihiis, gabadhna hooyadeed,
naagna soddohdeed. 36 Nin cadowgiisu waa dadka gurigiisa.
37 Kan aabbihiis iyo hooyadiis iga jecel, ima istaahilo, oo
kan wiilkiisa iyo gabadhdiisa iga jecel, ima istaahilo. 38 Kan
aan iskutallaabtiisa soo qaadan oo aan i soo raacin, ima
istaahilo. 39 Kan naftiisa helaa waa lumin doonaa, oo kan
naftiisa u lumiya aawaday waa heli doonaa. 40 Kan idin
aqbalaa wuu i aqbalaa, kan i aqbalaana, wuxuu aqbalaa kan
i soo diray. 41 Kan nebi ku aqbala nebi magiciis, wuxuu heli
doonaa nebi abaalkiis, kan qof xaq ah ku aqbala qof xaq ah
magiciis, wuxuu heli doonaa qof xaq ah abaalkiis. 42 Ku alla
kii kuwan yaryar koob biyo qabow oo keliya ku siiya qof xer
ah magiciis, runtii waxaan idinku leeyahay, abaalkiisu ka
lumi maayoba.

# 11

Goortii Ciise amarkiisa u dhammeeyey laba iyo tobankii
xertiisa ahaa, waxaa dhacay inuu meeshaas ka noqday
inuu magaalooyinkooda wax ku baro oo ku wacdiyo. 2
Goortii Yooxanaa xabsiga ka maqlay shuqulladii Masiixa,
laba xertiisii ah ayuu u soo diray 3 oo ku yidhi, Miyaad
tahay kan imanaya mise mid kale aannu dhawrnaa? 4
Markaasaa Ciise u jawaabay oo ku yidhi, Taga oo Yooxanaa
uga warrama waxaad aragteen iyo waxaad maqasheen. 5
Kuwii indhaha la'aa wax bay arkaan, kuwii lugahala'aana
way socdaan, kuwii baraska qabayna waa la nadiifiyey,
kuwii dhegahala'aana wax bay maqlaan, kuwii dhintayna
waa la kiciyey, masaakiintana injiilka waa lagu wacdiyaa, 6
oo waxaana barakaysan kan aan iga xumaanin. 7 Markay
tageen, Ciise wuxuu bilaabay inuu dadkii badnaa wax uga
sheego Yooxanaa oo wuxuu yidhi, Maxaad cidlada ugu
baxdeen? Ma waxay ahayd inaad soo aragtaan cawsduur
dabaylu ruxayso? 8 Laakiin maxaad u baxdeen? Ma waxay
ahayd inaad soo aragtaan nin dhar jilicsan qaba? Kuwa
dharka jilicsan qaba waxay joogaan guryaha boqorrada. 9
Laakiin maxaad u baxdeen? Ma waxay ahayd inaad nebi
soo aragtaan? Haah, waxaan idinku leeyahay, mid nebi
ka sarreeya. 10 Kanu waa kii laga qoray, Eeg, waxaan
hortaada soo dirayaa wargeeyahayga, Kan jidkaaga kuu
sii diyaargarayn doona hortaada. 11 Runtii waxaan idinku
leeyahay, Intii dumar ka dhalatay, mid Yooxanaa Baabtiisaha
ka weyn kama dhex kicin, laakiin kan boqortooyadii jannada
ugu yar ayaa ka weyn. 12 Tan iyo wakhtigii Yooxanaa
Baabtiisaha boqortooyada jannada waa la xoogay, oo kuwii
xoogayna ayaa qaatay. 13 Waayo, nebiyadii iyo sharcigu
waxay wax sii sheegeen ilaa Yooxanaa. 14 Haddii aad
doonaysaan inaad tan aqbashaan, Kanu waa Eliyaas kan
iman lahaa. 15 Kan dhego wax lagu maqlo lahu ha maqlo.
16 Maxaan qarnigan u ekaysiiyaa? Wuxuu u eg yahay
carruur suuqa fadhida oo kuwa kale u yeedhaysa, 17
iyagoo leh, Biibiile baannu idiin yeedhinnay, oo waad cayaari
weydeen, waannu baroorannay oo waad calaacali weydeen.
18 Waayo, Yooxanaa waa yimid isagoo aan waxba cunaynin
oo cabbaynin, oo waxay yidhaahdaan, Jinni buu qabaa.
19 Wiilka Aadanahuse waa yimid isagoo wax cunaya oo
cabbaya, oo waxay yidhaahdaan, Eeg, waa nin cir weyn
oo khamriyacab ah oo saaxiib la ah cashuurqaadayaal iyo
dembilayaal. Xigmaddu inay xaq tahay waa lagu caddeeyaa
shuqulladeeda. 20 Dabadeed wuxuu bilaabay inuu canaanto
magaalooyinkii uu shuqulladiisa xoogga leh badidooda ku
dhex sameeyey, waayo, ma ay toobadkeenin. 21 Waa
kuu hoog, Khorasinay; waa kuu hoog, Beytsayday; waayo,
shuqulladii xoogga lahaa oo laydinku dhex sameeyey,

haddii Turos iyo Siidoon lagu samayn lahaa, goor horay
toobadkeeni lahaayeen, iyagoo dhar joonyad ah gashan
oo dambas ku fadhiya. **22** Laakiin waxaan idinku leeyahay,
Maalinta xisaabta Turos iyo Siidoon waa idinka xisaab
fududaan doonaan. **23** Adiguna Kafarna'umay, samada ma
laguu sarraysiin doonaa? Waxaad ku degi doontaa Haadees,
waayo, haddii shuqulladii xoogga lahaa oo lagugu dhex
sameeyey, Sodom lagu samayn lahaa, ilaa maanta way
joogi lahayd. **(Hadēs g86)** **24** Laakiin waxaan idinku leeyahay,
Maalinta xisaabta, dalka Sodom ayaa kaa xisaab fududaan
doona. **25** Wakhtigaas Ciise ayaa hadalkan yidhi, Aabbow,
Rabbiga samada iyo dhulkow, waan kugu mahadnaqayaa,
waayo, waxyaalahan ayaad kuwa caqliga iyo garashada leh
ka qarisay, oo waxaad u muujisay ilma yaryar. **26** Haah,
Aabbow, waayo, sidaas ayaa kaa farxisay. **27** Aabbahay
wax walbaba waa ii dhiibay; oo ninna Wiilka garan maayo
Aabbaha maahee, oo ninna Aabbaha garan maayo Wiilka
maahee iyo kii Wiilku doonayo inuu u muujiyo. **28** Ii kaalaya
kulligiin kuwiinna hawshaysan oo culaabaysanow, oo anigu
waan idin nasin doonaa. **29** Harqoodkayga dushiinna
ku qaata oo wax iga barta; waayo, waan qaboobahay,
qalbigayguna waa hooseeyaa, oo naftiinna nasashaad u heli
doontaan. **30** Waayo, harqoodkaygu waa dhib yar yahay, oo
rarkayguna waa fudud yahay.

**12** Wakhtigaas Ciise wuxuu sabtidii dhex maray beeraha,
xertiisuna waa gaajaysnayd, oo waxay bilaabeen inay
sabuulladii jartaan oo cunaan. **2** Laakiin Farrisiintii goortay
arkeen, waxay isaga ku yidhaahdeen, Eeg, xertaadu waxay
samaynayaan wixii aan xalaal ahayn in sabtida la sameeyo.
**3** Laakiin wuxuu ku yidhi, Miyaydnaan akhriyin wixii Daa'uud
sameeyey goortuu gaajooday, isaga iyo kuwii la jiray, **4**
siduu gurigii Ilaah u galay oo uu u cunay kibistii tusniinta, tan
aan xalaal u ahayn inuu cuno ama in kuwii la jiray cunaan,
wadaaddada keliya maahee? **5** Ama miyaydnaan sharciga
ka akhriyin in wadaaddadii macbudka ku jira sabtida, ay
sabtida ka dhigaan wax aan quduus ahayn oo ay ka eed
la' yihiin? **6** Waxaan idinku leeyahay, Mid macbudka ka
sarreeya ayaa halkan jooga. **7** Haddaad aqoon lahaydeen
hadalkan micnihiisa, Waxaan doonayaa naxariis ee ma aha
allabari, kuwa aan eed lahayn ma aad xukunteen. **8** Waayo,
Wiilka Aadanahu waa sayidkii sabtida. **9** Markaasuu halkaas
ka tegey oo wuxuu galay sunagoggooda. **10** Oo waxaa
joogay nin gacan engegan. Goortaasay weyddiiyeen oo ku
yidhaahdeen, Ma xalaal baa in sabtida wax la bogsiiyo?
si ay ugu ashtakeeyaan. **11** Markaasuu wuxuu ku yidhi,
Ninkiinnee baa lax leh oo hadday sabtida god ku dhacdo,
aan soo qabanaynin oo aan soo bixinaynin? **12** Haddaba
nin intee buu ka qiima badan yahay lax! Sidaa darteed
waa xalaal in sabtida wanaag la sameeyo. **13** Markaasuu
ninkii ku yidhi, Gacantaada soo taag. Wuuna soo taagay,
oo way bogsatay sida tan kale. **14** Laakiin Farrisiintu waa
baxeen, oo waxay ka wada hadleen si ay u dilaan. **15**
Ciise goortuu ogaaday ayuu halkaas ka tegey, oo waxaa
raacay dad badan, dhammaantoodna wuu wada bogsiiyey.
**16** Wuxuuna ku amray inaanay cidna u sheegin, **17** si ay u
noqoto wixii lagaga dhex hadlay nebi Isayos isagoo leh,
**18** Eeg midiidinkaygii aan doortay, Kan aan jeclahay oo
ay naftaydu ku faraxsan tahay. Ruuxayga ayaan dul saari
doonaa, Wuxuuna quruumaha u sheegi doonaa xukunka. **19**
Ma uu ilaaqtami doono, mana qaylin doono, Ninnana codkiisa
jidadka kama maqli doono. **20** Cawsduur nabar leh ma
jebin doono, Dubaalad qiiqaysana ma demin doono, Ilaa uu
xukunka u soo bixiyo libta. **21** Oo quruumuhu waxay ku rajayn
doonaan magiciisa. **22** Markaasaa waxaa loo keenay jinnoole
indha la' oo carrab la', wuuna bogsiiyey, sidaa darteed ninkii
carrabka la'aa waa hadlay oo wax arkay. **23** Kolkaasaa dadkii
badnaa oo dhammu yaabeen oo waxay yidhaahdeen, Kanu
miyaanu ahayn ina Daa'uud? **24** Laakiin Farrisiintu goortay
maqleen, waxay yidhaahdeen, Kanu jinniyada wax kale
kuma saaro Be'elsebul oo ah madaxda jinniyada maahee.
**25** Laakiin isagoo garanaya fikirradooda ayuu ku yidhi,
Boqortooyo walba oo kala qaybsantaa, cid la' bay noqotaa,
oo magaalo walba iyo guri walba oo kala qaysamaa, ma
taagnaan doonaan. **26** Haddii Shayddaan Shayddaan saaro,
waa kala qaybsamaa. Haddaba boqortooyadiisu sidee bay
u taagnaan doontaa? **27** Oo anigu haddii aan jinniyada
ku saaro Be'elsebul, wiilashiinnu yay ku saaraan? Sidaa
darteed iyagu waxay ahaanayaan xaakinnadiinna. **28** Laakiin
haddaan jinniyada ku saaro Ruuxa Ilaah, waxaa idiin timid
boqortooyada Ilaah. **29** Ama qof sidee buu kan xoog leh
gurigiisa u geli karaa oo alaabtiisa u dhici karaa, haddaanu
kolkii hore kan xoogga leh xidhin? Markaasuu gurigiisa
dhici doonaa. **30** Kan aan ila jirin waa iga gees, oo kan
aan ila ururin waa firdhiyaa. **31** Sidaa darteed waxaan
idinku leeyahay, Dembi walba iyo cay walba waa loo cafiyi
doonaa dadka, laakiin cayda Ruuxa Quduuska ah ka gees
ah looma cafiyi doono. **32** Ku alla kii ku hadla hadal Wiilka
Aadanaha ka gees ah waa loo cafiyi doonaa, laakiin ku alla
kii ku hadla hadal Ruuxa Quduuska ah ka gees ah looma
cafiyi doono wakhtigan iyo wakhtiga iman doona. **(aiōn g165)**
**33** Ama geedka wanaajiya iyo midhihiisaba, ama geedka
xumeeya iyo midhihiisaba, waayo, geedka waxaa lagu gartaa
midhihiisa. **34** Dhal jilbisay, sidee baad wax wanaagsan ugu

hadli karaysaan idinkoo shar leh? Waayo, afku wuxuu ku
hadlaa waxa qalbiga ku badan. 35 Ninka wanaagsani wuxuu
maalka wanaagsan ka soo saaraa wax wanaagsan, kan
sharka lihina wuxuu maalka sharka leh ka soo saaraa wax
shar ah. 36 Waxaan idinku leeyahay, Eray kasta oo aan
waxtar lahayn oo dadku ku hadlo, maalinta xisaabta xisaab
bay ka bixin doonaan. 37 Waayo, hadalladaada ayaa lagugu
caddayn doonaa inaad xaq tahay, oo hadalladaada ayaa
lagugu xukumi doonaa. 38 Markaas qaar culimmada iyo
Farrisiinta ah ayaa u jawaabay oo ku yidhi, Macallimow,
waxaannu doonaynaa inaannu calaamo kaa aragno. 39
Markaasuu wuxuu u jawaabay oo ku yidhi, Qarni shareed oo
sina leh ayaa calaamo doonaya, calaamona lama siin doono
calaamada nebi Yoonis maahee. 40 Waayo, sida Yoonis
saddex maalmood iyo saddex habeen caloosha nibiriga ugu
jiray, sidaasuu Wiilka Aadanahuna saddex maalmood iyo
saddex habeen caloosha dhulka uga jiri doonaa. 41 Nimanka
Nineweh waxay xisaabta isla taagi doonaan dadka qarnigan,
wayna xukumi doonaan, waayo, waxay ku toobadkeeneen
wacdigii Yoonis, oo bal eeg, mid Yoonis ka weyn ayaa halkan
jooga. 42 Boqoradda koonfureed waxay xisaabta la kici
doontaa dadka qarnigan, wayna xukumi doontaa, waayo,
waxay ka timid meesha dhulka ugu shishaysa inay xigmadda
Sulaymaan maqasho, oo bal eeg, mid Sulaymaan ka weyn
ayaa halkan jooga. 43 Jinniga wasakhda leh goortuu ninka ka
baxo, wuxuu maraa meelo aan biyo lahayn isagoo nasasho
doonaya, mana helo. 44 Markaasuu yidhaahdaa, Waxaan ku
noqonayaa gurigaygii aan ka baxay, oo goortuu yimaado
wuxuu helaa isagoo madhan oo xaaqan oo hagaagsan. 45
Markaasuu tagaa oo wuxuu wataa toddoba jinni oo kale
oo ka xunxun isaga, wayna galaan oo halkaas joogaan.
Ninkaas wakhtigiisa dambe ayaa ka darnaada wakhtiga hore.
Sidaasay u noqon doontaa qarnigan sharka leh. 46 Intuu weli
dadkii badnaa la hadlayay, ayaa hooyadiis iyo walaalihiis
dibadda taagnaayeen oo doonayeen inay la hadlaan isaga.
47 Mid baa ku yidhi, Bal eeg, hooyadaa iyo walaalahaa ayaa
dibadda taagan oo doonaya inay kula hadlaan. 48 Laakiin
wuu u jawaabay oo ku yidhi kii u sheegay, Yaa hooyaday
ah oo yaa walaalahay ah? 49 Gacantiisa ayuu xertiisa ku
taagay oo yidhi, Waa kuwan hooyaday iyo walaalahay! 50
Waayo, ku alla kii yeela doonista Aabbahayga jannada ku
jira, kaasaa walaalkay iyo walaashay iyo hooyaday ah.

13 Maalintaas Ciise ayaa guriga ka baxay oo fadhiistay
badda agteeda, 2 oo waxaa u soo ururay dad faro
badan, sidaa darteed doonni ayuu fuulay oo fadhiistay, dadkii
badnaa oo dhammuna xeebtay taagnaayeen. 3 Markaasuu
wax badan masaallo ugu sheegay isagoo leh, Beerrey baa
baxay inuu wax beero, 4 oo intuu beerayay qaar baa jidka
geestiisa ku dhacay. Kolkaasaa shimbirro yimaadeen oo
cuneen. 5 Qaar kalena waxay ku dhaceen dhul dhagax
ah oo aan carro badan lahayn; kolkiiba way soo baxeen,
waayo, carradu hoos uma dheerayn, 6 laakiin qorraxdu
goortay soo baxday way gubteen, waana engegeen, waayo,
xidid ma lahayn. 7 Qaar kalena waxay ku dhaceen qodxan,
qodxantiina waa soo baxday oo ceejisay. 8 Qaar kalena
dhul wanaagsan bay ku dhaceen oo ay midho dhaleen,
mid boqol, midna lixdan, midna soddon. 9 Kan dhego wax
lagu maqlo lahu ha maqlo. 10 Markaasaa xertii u timid oo
ku tidhi, Maxaad masaallo ugula hadashaa? 11 Wuxuu u
jawaabay oo ku yidhi, Idinka waa laydin siiyaa inaad waxa
qarsoon ee boqortooyada jannada garataan, kuwaase lama
siiyo. 12 Waayo, ku alla kii wax haysta waa la siin doonaa,
waana loo badin doonaa, kii aan waxba haysanse, waa
laga qaadi doonaa wuxuu haysto. 13 Sidaa darteed ayaan
masaallo ugula hadlaa, waayo, iyagoo arkaya ma arkaan,
oo iyagoo maqlaya ma maqlaan, mana gartaan. 14 Iyagay
u noqotay waxsheegidda Isayos iyadoo leh, Maqal baad
ku maqli doontaan mana garan doontaan, Idinkoo arkaya
wax baad arki doontaan, idiinmana dhaadhici doonto. 15
Waayo, dadkan qalbigoodu waa qallafsanaaday, Oo dhib
bay dhegahooda wax ugu maqlaan, Indhahoodana way isku
qabteen; Si aanay indhaha wax ugu arkin, Oo dhegaha wax
ugu maqlin, Oo qalbiga wax ugu garan, Si aanay u soo
noqon, Oo aanan u bogsiin. 16 Laakiin waxaa barakaysan
indhihiinna, waayo, wax bay arkaan, iyo dhegihiinna, waayo,
wax bay maqlaan. 17 Runtii waxaan idinku leeyahay, Nebiyo
badan iyo niman xaq ah ayaa doonay inay arkaan waxaad
aragtaan, mana arkin, iyo inay maqlaan waxaad maqashaan,
mana ay maqlin. 18 Haddaba maqla masaalkii beerreyga. 19
Mid kasta oo hadalka boqortooyada maqla oo aan garan,
waxaa u yimaada kan sharka leh oo ka dhifta wixii qalbigiisa
lagu beeray. Waa kan kii jidka geestiisa lagu beeray. 20
Oo kii meelaha dhagaxa ah lagu beeray waa kan hadalka
maqla oo kolkiiba farxad ku qaata. 21 Xididse isagu ma leh,
laakiin wakhti yar buu sii jiraa, oo goortii dhib ama silec ugu
dhaco erayga aawadiis, markiiba waa ka xumaadaa. 22 Kii
qodxanta lagu dhex beerayna waa kan hadalka maqla oo
kawelwelidda dunidan iyo sasabidda maalka ayaa hadalka
ceejiya, oo wuxuu noqdaa midhola'aan. **(aiōn g165)** 23 Kii
dhulka wanaagsan lagu beeray waa kan erayga maqla oo
garta, oo isagu waa kan midho dhala, mid boqol, midna
lixdan, midna soddon. 24 Masaal kale ayuu u saaray, oo
wuxuu yidhi, Boqortooyada jannada waxaa loo ekaysiiyaa
nin beertiisa abuur wanaagsan ku abuuray. 25 Laakiin

waxaa yimid cadowgiisa intii dadku hurday, oo wuxuu
sarreenka kaga dhex abuuray gocondho, markaasuu tegey.
26 Laakiin markii geedku soo baxay oo uu midho dhalay,
markaasaa gocondhadii soo muuqatay. 27 Kolkaasaa odayga
reerka addoommadiisu u yimaadeen oo ku yidhaahdeen,
Sayidow, miyaanad abuur wanaagsan beertaada ku abuurin?
Xaggee haddaba gocondhadu uga timid? 28 Wuxuu ku
yidhi, Nin cadow ah ayaa waxan sameeyey. Addoommadii
waxay ku yidhaahdeen, Ma waxaad doonaysaa haddaba
inaannu tagno oo ururinno? 29 Wuxuuse ku yidhi, Maya,
waaba intaas oo goortaad gocondhada ururinaysaan aad
sarreenka la rurujisaan. 30 Labadoodu ha isla baxaan ilaa
beergooyska, oo wakhtiga beergooyska waxaan kuwa gooya
ku odhanayaa, Horta waxaad ururisaan gocondhadii, oo
xidhmo xidhmo isugu xidha in la gubo, laakiin sarreenka ku
soo ururiya maqsinkayga. 31 Masaal kale ayuu u saaray oo
wuxuu yidhi, Boqortooyada jannada waxay u eg tahay iniin
khardal, tan uu nin qaaday oo beertiisa ku beeray. 32 Taas
waa ka wada yar tahay iniinaha oo dhan, laakiin goortay
weynaato, way ka weyn tahay dhalatada oo dhan, oo waxay
noqotaa geed dheer si ay shimbirraha cirku u yimaadaan oo
laamaheeda ugu degaan. 33 Masaal kale ayuu kula hadlay,
Boqortooyada jannada waxay u eg tahay khamiir, kan naagi
intay qaadday ay saddex qiyaasood oo bur ah ku dhex
qooshtay ilaa ay wada khamiireen. 34 Waxan oo dhan ayaa
Ciise masaallo kula hadlay dadkii badnaa, oo masaalla'aan
kulama uu hadlin iyaga. 35 Si ay u noqoto wixii nebiga
lagaga dhex hadlay isagoo leh, Afkayga waxaan ku furayaa
masaallo, Oo wax qarsoonna tan iyo aasaaskii dunida ayaan
ku dhawaaqayaa. 36 Markaasuu dadkii badnaa ka tegey oo
guriga galay. Xertiisii ayaa u timid oo waxay ku yidhaahdeen,
Noo caddee masaalkii gocondhadii beerta. 37 Markaasuu
u jawaabay oo ku yidhi, Kii abuur wanaagsan abuuray
waa Wiilka Aadanaha, 38 beertuna waa dunida. Abuurka
wanaagsanna waa wiilasha boqortooyada, gocondhadiina
waa wiilasha kan sharka leh. 39 Oo cadowga abuurayna waa
Ibliiska, beergooyskuna waa dhammaadka wakhtigii dunida,
kuwa gooyaana waa malaa'igo. **(aiōn g165)** 40 Haddaba sidii
gocondhadii loo ururiyey oo dab loogu gubay, sidaasay
ahaan doontaa dhammaadka wakhtiga dunidu. **(aiōn g165)** 41
Wiilka Aadanaha ayaa malaa'igihiisa diri doona, oo waxay
boqortooyadiisa ka ururin doonaan wax kasta oo xumeeya
iyo kuwa dembiga fala. 42 Oo waxay ku tuuri doonaan
foornada dabka, halkaas waxaa jiri doonta baroor iyo ilko
jirriqsi. 43 Markaasaa kuwa xaqa ah ku dhalaali doonaan
boqortooyada Aabbahood sida qorraxdu u dhalaalayso. Kan
dhego lahu ha maqlo. 44 Boqortooyada jannadu waxay u eg
tahay maal beer ku qarsoon, kan nin intuu helay qarsaday,
oo farxad aawadeed ayuu baxay, oo wuxuu lahaa oo dhan
iibiyey, oo beertaas iibsaday. 45 Haddana boqortooyada
jannadu waxay u eg tahay baayacmushtari luul wanaagsan
doonaya. 46 Goortuu xabbad luul ah oo ganac weyn helay,
ayuu baxay, oo wuxuu lahaa oo dhan ayuu iibiyey oo
iibsaday. 47 Haddana boqortooyada jannadu waxay u eg
tahay shabag badda lagu tuuray oo cayn walba lagu ururiyey.
48 Kan markuu buuxsamay ay nimanku xeebta ku soo jiideen,
wayna fadhiisteen oo kuwii wanaagsanaa weelal bay ku
ururiyeen, kuwii xumaana way tuureen. 49 Sidaasay ahaan
doontaa dhammaadka wakhtiga dunidu. Malaa'igahu way
soo bixi doonaan oo waxay kuwa sharka leh ka dhex sooci
doonaan kuwa xaqa ah, **(aiōn g165)** 50 oo waxay ku tuuri
doonaan foornada dabka. Halkaa waxaa jiri doonta baroor
iyo ilko jirriqsi. 51 Waxyaalahan oo dhan ma garateen?
Waxay ku yidhaahdeen, Haah. 52 Markaasuu wuxuu ku
yidhi, Sidaa darteed mid kasta oo culimmada ka mid ah oo
xer looga dhigay boqortooyada jannada, wuxuu u eg yahay
nin reer odaygiis ah oo maalkiisa ka soo saara wax cusub
iyo wax duug ah. 53 Kolkii Ciise masaalladan dhammeeyey,
ayuu halkaas ka tegey. 54 Oo markuu waddankiisa yimid,
ayuu sunagoggooda wax ku baray, sidaa darteed way
yaabeen oo yidhaahdeen, Ninkanu xaggee buu ka helay
xigmaddan iyo shuqulladan xoogga leh? 55 Kanu miyaanu
ahayn wiilkii nijaarka? Miyaan hooyadiis la odhan Maryan?
Walaalihiisna Yacquub iyo Yoosee iyo Simoon iyo Yuudas?
56 Gabdhihii walaalihiis ahaana miyaanay inala wada joogin?
Haddaba kanu xaggee buu waxyaalahan oo dhan ka helay?
57 Wayna ka xumaadeen, laakiin Ciise wuxuu ku yidhi, Nebi
murwad la' ma jiro, waddankiisa iyo gurigiisa dhexdooda
maahee. 58 Halkaas shuqullo badan oo xoog leh kuma
samayn rumaysadla'aantooda aawadeed.

**14** Waagaas taliye Herodos ayaa warkii Ciise maqlay, 2
oo wuxuu midiidinyadiisii ku yidhi, Kanu waa Yooxanaa
Baabtiisaha. Kuwii dhintay ayuu ka soo sara kacay, sidaa
darteed shuqulladan xoogga leh waa ku dhex jiraan oo
shaqaynayaan. 3 Waayo, Herodos baa Yooxanaa qabtay oo
intuu xidhay ayuu u xabbisay, walaalkiis Filibos naagtiisii
Herodiya aawadeed. 4 Waayo, Yooxanaa wuxuu ku yidhi,
Xalaal kuuma aha inaad haysatid, 5 oo goortuu doonay
inuu dilo, dadkii badnaa ayuu ka baqay, maxaa yeelay,
waxay u haysteen sidii nebi oo kale. 6 Goortii maalintii la
xusuustay dhalashadii Herodos timid, gabadhii Herodiya
ayaa dadkii dhexdiisa ku cayaartay, oo Herodos ayay ka
farxisay. 7 Kolkaasuu dhaar ku ballanqaaday inuu siiyo wixii

ay weyddiisatoba. 8 Iyadoo hooyadeed hore ula soo talisay
ayay tidhi, Halkan xeedho igu soo sii madaxa Yooxanaa
Baabtiisaha. 9 Boqorkii waa calool xumaaday, laakiin
dhaarihiisii iyo kuwii la fadhiyey aawadood ayuu ku amray
in la siiyo. 10 Markaasuu cid diray oo Yooxanaa xabsigaa
madaxa lagaga gooyay. 11 Madaxiisiina waxaa lagu keenay
xeedho, oo gabadhii la siiyey, iyaduna hooyadeed bay u
keentay. 12 Markaasaa xertiisii timid, oo meydkiisay qaadeen
oo aaseen, kolkaasay tageen oo Ciise u warrameen. 13 Ciise
goortuu taas maqlay, ayuu halkaas doonni kaga soo noqday,
oo meel cidla ah ayuu keligiis tegey. Dadkii badnaana
goortay warkaas maqleen, ayay magaalooyinka lug kaga
soo raaceen. 14 Goortuu degay ayuu dad badan arkay,
wuuna u naxariistay, oo kuwoodii bukay ayuu bogsiiyey.
15 Goortii makhribkii la gaadhay ayaa xertiisii u timid oo
ku tidhi, Meeshu waa cidlo, wakhtigiina waa dhammaaday,
haddaba dadka dir si ay tuulooyinka u tagaan oo cunto
u soo iibsadaan. 16 Laakiin Ciise wuxuu ku yidhi, Uma
ay baahna inay tagaan, idinku siiya waxay cunaan. 17
Waxay ku yidhaahdeen, Halkan waxba kuma hayno shan
kibsood iyo laba kalluun maahee. 18 Markaasuu wuxuu ku
yidhi, Halkan iigu keena. 19 Kolkaasuu dadkii badnaa ku
amray inay cawska ku fadhiistaan. Isaguna wuxuu qaaday
shantii kibsood iyo labadii kalluun, oo intuu cirka eegay
ayuu barakeeyey oo kibistii kala jejebiyey oo xertiisii siiyey,
xertiina dadkii badnaa bay siiyeen. 20 Dhammaantood way
wada cuneen oo ka dhergeen, oo waxay soo gureen jajabkii
hadhay oo laba iyo toban dambiilood ka buuxa. 21 Kuwii
cunayna waxay ku dhowaayeen shan kun oo nin oo aan
naagaha iyo carruurtu ku jirin. 22 Kolkiiba wuxuu xertiisii ku
amray inay doonnida fuulaan oo ay hortiis tagaan dhanka
kale, intuu dadkii badnaa dirayo. 23 Goortuu dadkii badnaa
diray ayuu keligiis buurta fuulay inuu ku tukado, oo goortii
makhribka la gaadhay keli ahaantiis ayuu halkaas joogay.
24 Doonniduse durba wax badan ayay dhulka ka fogaatay
oo hirarku waa dhibeen, waayo, dabaysha ayaa ka gees
ahayd. 25 Wakhtiga gaadhkii afraad oo habeenka ayuu u
yimid isagoo badda ku dul socda. 26 Oo xertiisii goortay
arkeen isagoo badda ku dul socda, way nexeen oo waxay
yidhaahdeen, Waa muuqasho, oo baqdin bay la qayliyeen. 27
Markiiba Ciise waa la hadlay oo ku yidhi, Kalsoonaada, waa
aniga ee ha baqina. 28 Markaasaa Butros u jawaabay oo ku
yidhi, Sayidow, haddaad tahay adiga, igu amar inaan biyaha
kuugu dul imaado. 29 Wuxuu ku yidhi, Kaalay. Oo Butros
markuu doonnida ka degay ayuu biyaha ku dul socday inuu
Ciise u tago. 30 Laakiin goortuu dabayshii arkay ayuu baqay,
oo markuu bilaabay inuu dego ayuu qayliyey oo ku yidhi,
Sayidow, i badbaadi, 31 oo markiiba Ciise gacantiisuu u
taagay oo qabtay oo ku yidhi, Rumaysadyare yahow, maxaad
u shakiday? 32 Oo markay doonnida fuuleen, dabayshu waa
joogsatay. 33 Kuwii doonnida ku jirayna way caabudeen
isaga, oo waxay ku yidhaahdeen, Runtii, waxaad tahay
Wiilka Ilaah. 34 Oo markay gudbeen waxay yimaadeen dalka
Gennesared. 35 Oo nimankii halkaas degganaa goortay
garteen isaga, waxay cid u direen dalkaas ku wareegsan
oo dhan, oo waxay u keeneen kuwa buka oo dhan, 36 oo
waxay ka baryeen inay faraqa maradiisa keliya taabtaan, oo
kuwii taabtayna way bogsadeen.

15 Markaas waxaa Yeruusaalem Ciise uga yimid niman
Farrisiin iyo culimmo ah, oo waxay ku yidhaahdeen, 2
Xertaadu maxay xeerka waayeellada uga gudbaan? Waayo,
ma faro xashaan goortay kibis cunayaan. 3 Wuu u jawaabay
oo ku yidhi, Idinkuba maxaad amarkii Ilaah uga gudubtaan
xeerkiinna aawadiis? 4 Waayo, Ilaah wuxuu amray, Aabbahaa
iyo hooyadaa maamuus, oo Kan aabbihii ama hooyadii
caayaa, dhimasho ha ku dhammaado. 5 Laakiin waxaad
leedihiin, Kan aabbihii ama hooyadii ku yidhaahda, Wixii aan
idiin tari lahaa, hadiyad baan Ilaah ugu bixiyey, 6 aabbihii
ama hooyadii maamuusi maayo. Xeerkiinna ayaad erayga
Ilaah ku buriseen. 7 Labawejiilayaalow, Isayos aad buu wax
idiinka sii sheegay markuu yidhi, 8 Dadkanu bushimahooda
ayay igu maamuusaan, Laakiin qalbigoodu waa iga fog
yahay. 9 Si aan micne lahayn ayay ii caabudaan, Iyagoo
dadka wax ku baraya amarrada dadka. 10 Markaasuu dadkii
badnaa u yeedhay oo ku yidhi, Maqla oo garta. 11 Ma aha
waxa afka gala waxa ninka nijaaseeyaa, laakiin waxa afka
ka soo baxa, kaas ayaa ninka nijaaseeya. 12 Markaasaa
xertii u timid oo ku tidhi, Ma og tahay Farrisiintii inay ka
xumaadeen markay hadalkii maqleen? 13 Laakiin wuu u
jawaabay oo ku yidhi, Geed walba oo aan Aabbahayga
jannada ku jiraa abuurin waa la rujin doonaa. 14 Iska daaya.
Iyagu waa indhoolayaal indhoolayaal hagayaye. Laakiin nin
indha la' hadduu nin indha la' hago, labadooduba god bay
ku dhici doonaan. 15 Markaasaa Butros u jawaabay oo ku
yidhi, Masaalkaa noo caddee. 16 Kolkaasuu wuxuu yidhi,
Idinku weli ma garashola'aan baad tihiin? 17 Miyaydnaan
garanaynin, Wax kasta oo afka galaa calooshay tagaan, oo
waxaa lagu tuuraa meesha lagu saxaroodo? 18 Laakiin waxa
afka ka soo baxaa, qalbigay ka yimaadaan; oo kuwaas weeye
waxa ninka nijaaseeyaa. 19 Waayo, waxaa qalbiga ka soo
baxaa fikirrada sharka leh iyo dilidda iyo sinada iyo galmada
xaaraanta ah iyo tuuganimada iyo maragga beenta ah iyo
cayda. 20 Kuwan weeye waxa ninka nijaaseeyaa. Laakiin in

lagu cuno faro aan la maydhin, ninka ma nijaasayso. 21
Ciise ayaa meeshaas ka baxay, oo dhinacyada Turos iyo
Siidoon ayuu u leexday. 22 Oo naag reer Kancaan ah ayaa
soohdimahaas ka soo baxday oo qaylisay iyadoo leh, Ii
naxariiso, Sayidow, ina Daa'uudow. Gabadhayda jinni baa
si xun u waalaya. 23 Laakiin hadal uguma uu jawaabin.
Markaasaa xertiisii u timid oo ka bariday iyagoo leh, Eri,
waayo, way inaga daba qaylinaysaa. 24 Laakiin wuxuu u
jawaabay oo ku yidhi, La iima soo dirin, idaha lunsan oo
reer binu Israa'iil maahee. 25 Laakiin iyadu way u timid oo
sujuudday, oo waxay tidhi, Sayidow, i caawi. 26 Wuxuu u
jawaabay oo ku yidhi, Ma wanaagsana in carruurta kibistooda
la qaado oo eeyaha loo tuuro. 27 Waxay tidhi, Waa run,
Sayidow, laakiin weliba eeyahu waxay cunaan jajabka ka
dhaca miiska sayidkooda. 28 Markaasaa Ciise u jawaabay
oo ku yidhi, Naagtay, rumaysadkaagu waa weyn yahay
ee ha kuu noqoto sidaad doonaysid. Oo saacaddaasba
gabadheedii waa bogsatay. 29 Markaasaa Ciise halkaas ka
tegey, oo wuxuu u soo dhowaaday badda Galili, oo buurtuu
fuulay oo halkaasuu fadhiistay. 30 Kolkaasaa waxaa u yimid
dad fara badan oo wada kuwa curyaan ah iyo kuwa indha la'
iyo kuwa carrab la' iyo kuwa addimmo la' iyo qaar badan oo
kale, oo waxay iyaga dhigeen cagihiisa agtooda, wuuna
bogsiiyey. 31 Sidaas daraaddeed baa dadkii yaabay goortay
arkeen kuwii carrabka la'aa oo hadlaya iyo kuwii lugaha la'aa
oo bogsaday iyo kuwii curyaanka ahaa oo socda iyo kuwii
indhaha la'aa oo wax arkaya, waxayna ammaaneen Ilaaha
reer binu Israa'iil. 32 Markaasaa Ciise xertiisii u yeedhay oo
ku yidhi, Dadka badan ayaan u naxariisanayaa, waayo, durba
saddex maalmood ayay ila joogeen, oo waxay cunaanna ma
haystaan. Dooni maayo inaan diro iyagoo sooman waaba
intaas oo ay jidka ku itaal beelaane. 33 Xertiisii waxay
ku yidhaahdeen, Innagoo meel cidla ah joogna, xaggee
baynu ka helaynaa kibis intaa le'eg in dad sida u badanu
ka dhergaan? 34 Ciise ayaa ku yidhi Immisa kibsood baad
haysaan? Waxay yidhaahdeen, Toddoba iyo waxoogaa
kalluun yaryar ah. 35 Oo wuxuu dadkii badnaa ku amray
inay dhulka fadhiistaan. 36 Markaasuu toddobadii kibsood
iyo kalluunkii soo qaaday, oo goortuu ku mahadnaqay ayuu
kala jejebiyey oo xertii siiyey, xertiina dadkii badnaa ayay
siiyeen. 37 Dhammaantood way wada cuneen oo dhergeen,
oo waxay soo ururiyeen toddoba dambiilood oo ka buuxa
jajabkii hadhay. 38 Dadkii cunayna waxay ahaayeen afar kun
oo rag ah oo aan naagaha iyo carruurtu ku jirin. 39 Kolkuu
dadkii badnaa diray dabadeed ayuu doonni fuulay, oo wuxuu
galay soohdimaha Magadan.

16 Waxaa u yimid Farrisiintii iyo Sadukiintii iyagoo
jirrabaya, oo waxay ka baryeen inuu calaamo cirka ka
tuso. 2 Wuxuu u jawaabay oo ku yidhi, Goortii ay makhrib
tahay waxaad tidhaahdaan, Waxay noqonaysaa maalin
wanaagsan, waayo, cirku waa guduudan yahay. 3 Aroortiina
waxaad tidhaahdaan, Maanta roob baa da'aya, waayo,
cirku waa guduudan yahay, waana kicinsan yahay. Waxaad
taqaaniin sida loo garto muuqashada cirka, laakiin ma kala
garan kartaan calaamooyinka wakhtiyada. 4 Waxaa calaamo
doonaya qarni shareed oo sina leh, calaamose lama siin
doono calaamadii Yoonis maahee. Markaasuu iska daayay
iyaga oo ka tegey. 5 Markii xertii dhanka kale timid, waxay
illoobeen inay kibis sii qaataan. 6 Ciise ayaa ku yidhi,
Iska eega oo iska jira khamiirka Farrisiinta iyo Sadukiinta.
7 Markaasay isla wada hadleen oo isku yidhaahdeen,
Sababtaasu waa kibistii aannan soo qaadan aawadeed. 8
Ciise oo gartay ayaa ku yidhi, Maxaad isula hadlaysaan,
rumaysadyarayaalow? Ma kibista aydnan haysan aawadeed
baa? 9 Miyaydnaan weli garan ama miyaydnaan xusuusnayn
shantii kibsood oo shantii kun cuntay, iyo intii dambiilood oo
aad ka soo ururiseen? 10 Ama toddobadii kibsood oo afartii
kun cuntay iyo intii dambiilood oo aad ka soo ururiseen?
11 Sidee baad u garan weydeen inaanan kibis idinkala
hadlayn? Iska jira khamiirka Farrisiinta iyo Sadukiinta. 12
Markaasay garteen inaanu ku lahayn, Iska jira khamiirka
kibista, laakiin waxbaridda Farrisiinta iyo Sadukiinta. 13 Ciise
goortuu dhinacyada Kaysariya Filibos yimid ayuu xertiisii
weyddiiyey, oo wuxuu ku yidhi, Dadku yay ku sheegaan
Wiilka Aadanaha? 14 Waxay yidhaahdeen, Qaar waxay
yidhaahdaan, Yooxanaa Baabtiisaha, qaarna Eliyaas, qaar
kalena waxay yidhaahdaan, Yeremyaah, ama nebiyada
midkood. 15 Markaasuu wuxuu ku yidhi, Idinkuse yaad igu
sheegtaan? 16 Simoon Butros ayaa u jawaabay oo wuxuu
ku yidhi, Waxaad tahay Masiixa ah Wiilka Ilaaha nool. 17
Ciise ayaa u jawaabay oo ku yidhi, Waad barakaysan tahay
Simoon ina Yoonis, waayo, bini-aadmi tan kuuma muujin,
laakiin Aabbahayga jannada ku jira ayaa kuu muujiyey.
18 Anigu waxaan kugu leeyahay, Butros baad tahay, oo
dhagaxan ayaan ka dul dhisan doonaa kiniisaddayda, oo
albaabbadii Haadees kama adkaan doonaan. (Hadēs g86) 19
Waxaan ku siin doonaa furayaasha boqortooyada jannada,
oo wax alla wixii aad dhulka ku xidho ayaa jannada ku
xidhnaan doona, oo wax alla wixii aad dhulka ku furto
ayaa jannada ku furnaan doona. 20 Markaasuu xertii ku
amray inaanay cidna u sheegin inuu Masiixa yahay. 21
Kolkaa dabadeed Ciise Masiix ayaa bilaabay inuu xertiisii u
sheego inay waajib ugu tahay inuu Yeruusaalem tago, oo

xanuun badan ka helo waayeellada iyo wadaaddada sare
iyo culimmada, oo la dilo, oo maalinta saddexaad la sara
kiciyo. 22 Markaasaa Butros gees u waday oo bilaabay inuu
canaanto, oo wuxuu ku yidhi, Ilaah ha kaa hayo, Sayidow,
taasu weligaa kuuma noqon doonto. 23 Laakiin Butros ayuu
u soo jeestay oo ku yidhi, Gadaal iga mar, Shayddaan
yahow. Waad i xumaynaysaaye, waayo, waxyaalaha Ilaah
kama fikirtid, waxaadse ka fikirtaa waxyaalaha dadka. 24
Markaasaa Ciise wuxuu xertiisii ku yidhi, Mid uun hadduu
doonayo inuu iga daba yimaado, ha dayriyo doonistiisa,
iskutallaabtiisana ha soo qaato oo ha i soo raaco. 25 Kan
doonaya inuu naftiisa badbaadiyo, waa lumin doonaa, oo kan
naftiisa u lumiya aawaday wuu heli doonaa. 26 Waayo, nin
maxay u taraysaa hadduu dunida oo dhan helo oo uu naftiisa
lumiyo? Ama nin muxuu u bixiyaa naftiisa beddelkeeda?
27 Waayo, Wiilka Aadanahu wuxuu ammaanta Aabbihiis
kula iman doonaa malaa'igihiisa, markaasuu nin kasta ugu
abaalgudi doonaa siduu falay. 28 Runtii waxaan idinku
leeyahay, Kuwa halkan taagan qaarkood sinaba dhimasho
uma dhadhamin doonaan ilaa ay arkaan Wiilka Aadanaha
oo boqortooyadiisa ku imanaya.

**17** Lix maalmood dabadeed Ciise wuxuu waday Butros iyo
Yacquub iyo walaalkiis Yooxanaa, oo wuxuu keligood
geeyey buur dheer. 2 Hortoodana ayuu ku beddelmay,
wejigiisuna sida qorraxda oo kale ayuu u dhalaalay,
dharkiisuna sida nuurka oo kale ayuu u caddaaday. 3 Oo
bal eeg, waxaa iyaga u muuqday Muuse iyo Eliyaas oo la
hadlaya isaga. 4 Markaasaa Butros u jawaabay oo wuxuu
Ciise ku yidhi, Sayidow, waxaa inoo wanaagsan inaynu
halkan joogno. Haddaad doonayso saddex waab ayaan
halkan ka dhisayaa, mid adaan kuu dhisayaa, midna Muuse,
midna Eliyaas. 5 Intuu weli hadlayay, daruur dhalaalaysa
ayaa hadhaysay, oo cod baa daruurtii ka soo baxay oo yidhi,
Kanu waa Wiilkayga aan jeclahay oo aan ku faraxsanahay.
Maqla isaga. 6 Xertiina goortay maqleen, ayay wejigooda
u dhaceen, aad bayna u baqeen. 7 Markaasaa Ciise u
yimid oo taabtay oo ku yidhi, Kaca, hana baqina. 8 Goortay
indhahooda kor u qaadeen, cidna ma ay arkin Ciise keliya
maahee. 9 Markay buurta ka soo degayeen, Ciise ayaa
amray oo wuxuu ku yidhi, Ninna ha u sheegina wixii aad
aragteen intaanu Wiilka Aadanahu kuwii dhintay ka soo sara
kicin. 10 Xertiisii waxay weyddiiyeen oo ku yidhaahdeen,
Haddaba culimmadu maxay u yidhaahdaan, Eliyaas waa
inuu horta yimaado? 11 Markaasuu u jawaabay oo ku yidhi,
Waa run, Eliyaas waa imanayaa, oo wax walba ayuu soo
celin doonaa. 12 Laakiin waxaan idinku leeyahay, Eliyaas
horuu u yimid, wayna garan waayeen, laakiin wax kasta
oo ay doonayeen ayay ku sameeyeen isaga. Sidaas oo
kalena Wiilka Aadanahu xanuun buu ka heli doonaa iyaga.
13 Markaasaa xertiisii garatay inuu kala hadlay Yooxanaa
Baabtiisaha. 14 Goortay dadkii badnaa u yimaadeen, ayaa
nin u yimid isaga, oo intuu u jilba joogsaday ayuu ku yidhi,
15 Sayidow, wiilkayga u naxariiso, waayo, suuxdin buu
qabaa oo aad buu u xanuunsadaa, oo marar badan wuxuu
ku dhacaa dabka, marar badanna biyo, 16 oo waxaan u
keenay xertaada, wayna bogsiin kari waayeen. 17 Ciise
wuxuu u jawaabay oo ku yidhi, Qarni yahow rumaysadka
daranu oo madaxa adagu, ilaa goormaan idinla jiri doonaa,
oo ilaa goormaan idiin dulqaadan doonaa? Halkan iigu
keena isaga. 18 Markaasaa Ciise canaantay, oo jinnigii
waa ka baxay, saacaddaasna wiilkii waa bogsaday. 19
Markaas xertii ayaa keli ahaan Ciise ugu timid oo ku
tidhi, Annagu maxaannu u saari kari waynay? 20 Wuxuu
ku yidhi, Waa rumaysadyaraantiinna aawadeed. Runtii
waxaan idinku leeyahay, Haddaad leedihiin rumaysad iniin
khardal le'eg, waxaad buurtan ku odhan doontaan, Halkan
ka dhaqaaq oo halkaas tag, wayna dhaqaaqi doontaa,
oo waxba ma kari waayi doontaan. 21 Laakiin caynkan
waxba kuma soo baxo tukasho iyo soon maahee. 22
Intay Galili ku warwareegayeen, Ciise ayaa ku yidhi, Wiilka
Aadanaha ayaa dadka loo gacangelin doonaa. 23 Wayna dili
doonaan, maalinta saddexaadna waa la sara kicin doonaa.
Markaasay aad u calool xumaadeen. 24 Goortay Kafarna'um
yimaadeen, waxaa Butros u yimid kuwii labada daraakmo
qaadi jiray, oo waxay ku yidhaahdeen, Macallinkiinnu labadii
daraakmo oo cashuurta ahayd sow ma bixiyo? 25 Wuxuu
yidhi, Haah, wuu bixiyaa. Oo goortuu guriga galay Ciise
ayaa hadal hor mariyey oo ku yidhi, Maxay kula tahay,
Simoonow? Boqorrada dhulku yay ka qaadaan cashuurta iyo
baadda? Wiilashooda ama shisheeyaha? 26 Goortuu yidhi,
Shisheeyaha, Ciise ayaa ku yidhi, Haddaba wiilashu waa ka
reebban yihiin. 27 Laakiin si aynan u xumayn iyaga, badda
tag, oo jillaab ku tuur, oo kalluunka kolka hore soo baxa
soo qaad, oo goortaad afkiisa furtid waxaad ka heli doontaa
istater. Kaas qaad oo inooga bixi aniga iyo adigaba.

**18** Saacaddaas ayaa xertii u timid Ciise oo waxay ku
yidhaahdeen, Yaa haddaba boqortooyada jannada
ugu weyn? 2 Markaasuu wuxuu u yeedhay ilmo yar, oo
dhexdooda ayuu joojiyey oo yidhi, 3 Runtii waxaan idinku
leeyahay, Haddaydnan soo jeesan oo aydnaan noqon sida
carruur oo kale, boqortooyada jannada ma geli doontaan. 4
Ku alla kii haddaba isu hoosaysiiya sida ilmahan oo kale,

kaas ayaa ugu weyn boqortooyada jannada, 5 oo ku alla kii
magacayga ilmahan oo kale ku aqbalaa, wuu i aqbalaa. 6
Laakiin ku alla kii xumeeya yaryarkan i rumaystay midkood,
waxaa u roon in dhagaxshiid luqunta looga lalmiyo oo badda
moolkeeda lagu hafiyo. 7 Waa u hoog dunida xumaanta
aawadeed! Xumaantu waa inay timaado, laakiin waa u hoog
ninka ay xumaantu ka timaado. 8 Haddii gacantaadu ama
cagtaadu ku xumayso, iska jar, oo iska tuur. Waxaa kuu
wanaagsan inaad gacanla'aan iyo lugla'aan nolosha ku
gashid intii adigoo laba gacmood iyo laba cagood leh lagugu
tuuri lahaa dabka weligiis ah. **(aiōnios g166)** 9 Haddii ishaaduna
ku xumayso iska bixi oo iska tuur. Waxaa kuu wanaagsan
inaad il keliya nolosha ku gashid intii adigoo laba indhood
leh lagugu tuuri lahaa jahannamada dabka ah. **(Geenna g1067)**
10 Iska jira inaydnaan yaryarkan midkood quudhsan, waayo,
waxaan idinku leeyahay, Mar walba malaa'igahooda jannada
ku jira ayaa wejiga Aabbahayga jannada ku jira eegaya. 11
Waayo, Wiilka Aadanahu wuxuu u yimid inuu badbaadsho
kii lumay. 12 Maxay idinla tahay, Nin hadduu tiro ido ah
leeyahay oo middood ay ka hallowdo, miyaanu sagaal iyo
sagaashanka buuraha dushooda kaga tegin oo doonin tii
hallowday? 13 Oo hadday noqoto inuu helo, runtii waxaan
idinku leeyahay, taas aad buu ugu farxaa si uusan ugu farxin
sagaal iyo sagaashankii aan hallaabin. 14 Sidaas oo kale,
ma aha doonista Aabbihiinna jannada ku jira in yaryarkan
midkood lumo. 15 Oo haddii walaalkaa kugu dembaabo, u
tag oo canaano, adiga iyo isaga keli ahaantiinna. Hadduu ku
maqlo, walaalkaa waad soo ceshatay. 16 Laakiin hadduu ku
maqli waayo, mid ama laba kale wado, si hadal walba loogu
adkeeyo afka laba ama saddex markhaati. 17 Oo hadduu
iyaga maqli waayo, dadka kiniisadda u sheeg, oo hadduu
dadka kiniisadda maqli waayona, ha kuu ahaado sida qof
aan Ilaah aaminin iyo cashuurqaade. 18 Runtii waxaan idinku
leeyahay, Wax alla wixii aad dhulka ku xidhaan ayaa jannada
ku xidhnaan doona, oo wax alla wixii aad dhulka ku furtaan
ayaa jannada ku furnaan doona. 19 Weliba waxaan idinku
leeyahay, Haddii laba idinka mid ahu dhulka ku heshiiyaan
wax kastoo ay baryaan, way uga noqon doontaa xagga
Aabbahayga jannada ku jira. 20 Waayo, meeshii laba ama
saddex qof ay magacayga isugu soo ururaan, halkaas anigu
dhexdoodaan joogaa. 21 Markaas Butros ayaa u yimid oo ku
yidhi, Sayidow, immisa goor baan cafiyaa walaalkay hadduu
igu dembaabo? Ma ilaa toddoba goor baa? 22 Ciise ayaa
ku yidhi, Kugu odhan maayo, Ilaa toddoba goor, laakiin,
Ilaa toddobaatan goor oo toddoba ah. 23 Sidaa darteed
boqortooyada jannada waxaa loo ekaysiiyaa nin boqor ah
oo doonayay inuu addoommadiisa ka xisaab qaato. 24
Goortuu bilaabay inuu xisaab qaato waxaa loo keenay nin
toban kun oo talanti uu ku lahaa. 25 Laakiin wuxuu ku bixiyo
ma uu haysan. Markaasaa sayidkii wuxuu ku amray in la
iibiyo isaga iyo naagtiisa iyo carruurtiisa iyo wuxuu lahaa oo
dhan, oo lagu bixiyo. 26 Addoonkii haddaba wuu dhacay,
oo intuu sujuuday, ayuu wuxuu ku yidhi, Ii dulqaado, anna
waan wada bixin doonaaye. 27 Markaasaa addoonkaas
sayidkiisii u naxariistay, wuuna sii daayay, oo amaahdii wuu
u dhaafay. 28 Laakiin addoonkaas ayaa baxay oo helay
mid ka mid ah addoommadii uu la shaqayn jiray, kii uu ku
lahaa boqol dinaar. Wuu qabtay oo intuu ceejiyey ayuu
ku yidhi, Bixi waxa lagugu leeyahay. 29 Addoonkii uu la
shaqayn jiray ayaa haddaba cagihiisii isku riday oo baryay,
oo ku yidhi, Ii dulqaado, anna waan bixin doonaaye. 30
Isaguse ma uu doonaynin, laakiin wuu baxay oo xabsiga
ku tuuray ilaa uu bixiyo wixii lagu lahaa. 31 Haddaba kuwii
la shaqayn jiray, goortay arkeen wixii dhacay, aad bay u
calool xumaadeen, oo intay sayidkooda u yimaadeen, ayay
u sheegeen wixii dhacay oo dhan. 32 Markaasaa sayidkiisii
u yeedhay oo ku yidhi, Addoon yahow sharkaluhu! Waxaan
kugu lahaa oo dhan waan kuu dhaafay, waayo, waad i
bariday. 33 Miyaanad lahayn inaad kii kula shaqayn jiray u
naxariisatid sidaan anigu kuugu naxariistay? 34 Markaasaa
sayidkiisu cadhooday oo u dhiibay kuwa dadka silciya ilaa
uu bixiyo wixii lagu lahaa oo dhan. 35 Sidaas oo kalena
ayaa Aabbahayga jannada ku jiraa idinku samayn doonaa,
haddaan midkiin waliba qalbiga ka cafiyin walaalkiis.

**19** Waxaa dhacay in, goortuu Ciise hadalladan
dhammeeyey, uu Galili ka tegey, oo wuxuu yimid
soohdimaha Yahuudiya, oo Webi Urdun ka shisheeya. 2
Waxaana soo raacay dad aad u badan, oo halkaas ayuu
ku bogsiiyey iyaga. 3 Markaasaa Farrisiintii u timid, iyagoo
jirrabaya, oo waxay ku yidhaahdeen, Ma xalaal baa in nin
sabab kasta naagtiisa ku furo? 4 Wuxuu u jawaabay oo
ku yidhi, Miyaydnaan akhriyin, Kii bilowgii uumay iyaga
wuxuu ka dhigay lab iyo dhaddig, 5 oo wuxuu yidhi,
Sababtaas aawadeed nin wuxuu ka tegayaa aabbihiis iyo
hooyadiis, wuxuuna la joogayaa naagtiisa, oo labaduba
waxay noqonayaan isku jidh? 6 Sidaa darteed haatan iyagu
laba ma aha, laakiin waa isku jidh. Haddaba wixii Ilaah
isku xidhay, ninna yaanu kala furin. 7 Markaasay waxay ku
yidhaahdeen, Haddaba Muuse muxuu u amray in warqaddii
furiinta iyada la siiyo oo la furo? 8 Wuxuu ku yidhi, Maxaa
yeelay, Muuse wuxuu idiinku fasaxay inaad naagihiinna
furtaan qalbi engegnaantiinna aawadeed, laakiin bilowgii
sidaas ma ay ahayn. 9 Waxaan idinku leeyahay, Ku alla

kii naagtiisa ku fura wax aan sino ahayn, oo mid kale
guursadaa, wuu sinaystaa. Oo kii guursada tii la furay wuu
sinaystaa. 10 Xertiisii waxay ku yidhaahdeen, Haddii nin
xaalkiisu sidan yahay xagga naagtiisa, in la guursadaaba ma
wanaagsana. 11 Laakiin wuxuu ku yidhi, Dadka oo dhammu
ereygan ma wada aqbali karaan, kuwii la siiyey mooyaane.
12 Waayo, waxaa jira bohommo sidaas kaga dhashay uurkii
hooyadood, oo waxaa jira bohommo dadku dhufaanay, oo
waxaa jira bohommo isaga dhigay bohommo boqortooyada
jannada aawadeed. Kii hadalkan aqbali karaa, ha aqbalo.
13 Markaasaa ilmo yaryar loo keenay inuu gacmiihiisa
saaro oo uu u duceeyo, laakiin xertii ayaa canaanatay. 14
Markaasaa Ciise wuxuu ku yidhi, Ilmaha daaya oo ha u
diidina inay ii yimaadaan, waayo, kuwan oo kale ayaa ka
mid ah boqortooyada jannada. 15 Gacmihiisa ayuu saaray
iyaga, markaasuu meeshaas ka tegey. 16 Oo mid baa intuu
yimid ku yidhi, Macallin wanaagsanow, maxaa wanaagsan
oo aan sameeyaa inaan nolosha weligeed ah helo? **(aiōnios
g166)** 17 Wuxuu ku yidhi, Maxaad wax iiga weyddiinaysaa
wanaagga? Waxaa jira mid wanaagsan. Haddaad doonaysid
inaad nolosha gashid, qaynuunnada dhawr. 18 Wuxuu ku
yidhi, Kuwee? Ciise ayaa ku yidhi, Waa inaanad qudh
gooyn, Waa inaanad sinaysan, Wan inaanad wax xadin, Waa
inaanad marag been ah furin. 19 Aabbahaa iyo hooyadaa
maamuus, oo Waa inaad deriskaaga u jeclaataa sidaad
naftaada u jeceshahay. 20 Ninkii dhallinyarada ahaa ayaa
ku yidhi, Kuwaas oo dhan ayaan dhawray. Maxaa weli ii
dhiman? 21 Ciise ayaa ku yidhi, Haddaad doonaysid inaad
samaatid, tag oo iibi waxaad haysatid, oo masaakiinta sii, oo
waxaad jannada ku lahaan doontaa maal; ee kaalay oo i
soo raac. 22 Ninkii dhallinyarada ahaa goortuu hadalkaas
maqlay ayuu baxay isagoo calool xun, waayo, wuxuu ahaa
mid waxyaalo badan leh. 23 Markaasaa Ciise wuxuu xertiisii
ku yidhi, Runtii waxaan idinku leeyahay, Nin hodan ah inuu
boqortooyada jannada galo waa ku adag tahay. 24 Haddana
waxaan idinku leeyahay, Nin hodan ah inuu boqortooyada
Ilaah galo waxaa ka hawl yar in awr irbad daloolkeed ka
duso. 25 Xertii goortay maqleen aad bay u yaabeen, oo
waxay ku yidhaahdeen, Haddaba yaa badbaadi kara? 26
Ciise intuu eegay ayuu ku yidhi, Waxanu uma suurtoobaan
dadka, laakiin wax waluba waa u suurtoobaan Ilaah. 27
Markaas Butros ayaa u jawaabay oo wuxuu ku yidhi, Annagu
wax walba waannu ka soo wada tagnay, waana ku raacnay.
Maxaannu haddaba heli doonnaa? 28 Ciise ayaa ku yidhi,
Runtii waxaan idinku leeyahay, Kuwiinna i soo raacay,
wakhtiga cusboonaysiinta, goortii Wiilka Aadanahu carshiga
ammaantiisa ku fadhiisto, idinkuna waxaad ku fadhiisan
doontaan laba iyo toban carshi, idinkoo xukumaya laba-
iyo-tobanka qolo oo Israa'iil. 29 Oo mid walba oo ka tegey
guryo, ama walaalo, ama aabbe, ama hooyo, ama carruur,
ama beero, magacayga aawadiis, wuxuu heli doonaa boqol
laab, oo wuxuu dhaxli doonaa nolosha weligeed ah. **(aiōnios
g166)** 30 Kuwa badan oo hore waa dambayn doonaan, kuwa
dambena waa horrayn doonaan.

**20** Boqortooyada jannada waxay u eg tahay nin oday
reer u ah oo aroortii hore baxay inuu shaqaalayaal u
kireeyo beertiisa canabka ah. 2 Oo goortuu shaqaalayaal
maalintii kula heshiiyey dinaar, ayuu beertiisii canabka ahayd
u diray iyagii. 3 Oo saacaddii saddexaad ayuu baxay, oo
wuxuu arkay qaar kale oo suuqa shuqulla'aan la taagtaagan,
4 oo wuxuu kuwaas ku yidhi, Idinkuna beerta canabka ah
taga oo wixii xaq ah ayaan idin siin doonaa. Wayna tageen.
5 Haddana saacaddii lixaad iyo saacaddii sagaalaad wuu
baxay oo sidaas oo kale ayuu sameeyey. 6 Saacaddii
koob iyo tobnaad intuu baxay wuxuu arkay qaar kale oo
taagtaagan, oo wuxuu ku yidhi, Maxaad maalintii oo dhan
halkan shuqulla'aan ula taagtaagan tihiin? 7 Waxay ku
yidhaahdeen Maxaa yeelay, cidna nama kiraysan. Wuxuu ku
yidhi, Idinkuna beerta canabka ah taga. 8 Goortii makhribkii
la gaadhay, sayidkii beertii canabka ahayd ayaa wakiilkiisii
ku yidhi, Shaqaalayaasha u yeedh oo mushahaaradooda sii,
oo waxaad ka bilowdaa kuwii ugu dambeeyey ilaa kuwii ugu
horreeyey. 9 Goortay yimaadeen, kuwii saacaddii koob iyo
tobnaad baxay, waxay wada heleen dinaar dinaar. 10 Kuwii
hore goortay yimaadeen waxay u malaynayeen inay wax
ka badan helayaan, iyaguna sidaas oo kale dinaar dinaar
bay heleen. 11 Oo intay qaadanayeen ayay odaygii reerka
ku gunuunaceen, 12 oo waxay ku yidhaahdeen, Kuwan
dambeeyey waxay shaqeeyeen saacad keliya, oo waad
nagala mid dhigtay annagoo sidnay shaqadii cuslayd ee
maalinta iyo kulaylkii. 13 Laakiin wuu u jawaabay oo midkood
ku yidhi, Saaxiibow, xumaan kuguma aan samayn. Sow
dinaar igulama heshiin? 14 Waxaaga qaado oo tag. Waxaan
doonayaa inaan kan ugu dambeeya siiyo intaan ku siiyey
oo kale. 15 Miyaynan igu hagaagsanayn inaan waxayga
ku sameeyo wixii aan doonayo? Ma waxaase ishaadu u
xun tahay wanaagsanaantayda aawadeed? 16 Sidaasay
kuwa dambe u horrayn doonaan, kuwa horena u dambayn
doonaan. Waayo, kuwo badan baa loo yeedhay, laakiin
kuwo yar baa la doortay. 17 Intuu Ciise Yeruusaalem ku
socday, laba-iyo-tobankii ayuu keli ahaantood waday, oo intay
jidka ku socdeen ayuu ku yidhi, 18 Waxaynu ku soconnaa
Yeruusaalem. Wiilka Aadanahana waxaa loo dhiibi doonaa

wadaaddada sare iyo culimmada; oo waxay ku xukumi
doonaan dhimasho. 19 Waxayna u dhiibi doonaan dadka
aan Yuhuudda ahayn inay ku kajamaan oo karbaashaan oo
iskutallaabta ku qodbaan. Maalinta saddexaadna waa la sara
kicin doonaa. 20 Markaasaa waxaa u timid wiilashii Sebedi
hooyadood iyadoo wadata wiilasheedii, wayna u sujuudday
oo wax ka bariday. 21 Wuxuu ku yidhi, Maxaad doonaysaa?
Waxay ku tidhi, Amar in labadaydan wiil mid midigtaada,
midna bidixdaada, boqortooyadaada ka fadhiistaan. 22
Laakiin Ciise ayaa u jawaabay oo wuxuu ku yidhi, Garan
maysaan waxaad weyddiisanaysaan. Ma karaysaan inaad
ka cabtaan koobka aan ku dhowahay inaan ka cabbo, iyo
in laydinku baabtiiso baabtiiska laygu baabtiisay? Waxay
ku yidhaahdeen, Waannu karaynaa. 23 Wuxuu ku yidhi,
Runtii koobkayga waad ka cabbi doontaan, oo baabtiiska
laygu baabtiisay waa laydinku baabtiisi doonaa, laakiin inaad
midigtayda iyo bidixdayda fadhiisataan anigu malihi inaan
idin siiyo, laakiin waxaa la siin doonaa kuwa Aabbahay u
diyaargareeyey. 24 Tobankii goortay taas maqleen ayay
labadii walaalaha ahayd u cadhoodeen. 25 Laakiin Ciise
ayaa u yeedhay oo ku yidhi, Idinku waad garanaysaan
in quruumaha madaxdoodu ay u taliyaan, oo kuwooda
u waaweynna ay xukun ku leeyihiin. 26 Laakiin sidaasu
dhexdiinna ahaan mayso, laakiin ku alla kii doonaya inuu
dhexdiinna u weynaado, midiidinkiinna waa inuu ahaado,
27 oo ku alla kii doonaya inuu idiin horreeyo, addoonkiinna
waa inuu ahaado, 28 sida Wiilka Aadanahu uusan ugu
iman in loo adeego laakiin inuu adeego iyo inuu naftiisa
dad badan furashadooda u bixiyo. 29 Kolkay Yerixoo ka
tegayeen waxaa raacay dad aad u badan. 30 Oo laba nin
oo indha la' ayaa jidka ag fadhiyey, oo goortay maqleen in
Ciise ag marayo ayay qayliyeen iyagoo leh, Sayidow, ina
Daa'uudow, noo naxariiso. 31 Dadkii badnaa ayaa canaantay
si ay u aamusaan, laakiin si ka badan ayay u qayliyeen
iyagoo leh, Sayidow, ina Daa'uudow, noo naxariiso. 32
Markaasaa Ciise joogsaday, oo intuu u yeedhay ayuu ku
yidhi, Maxaad doonaysaan inaan idiin sameeyo? 33 Waxay
ku yidhaahdeen, Sayidow, in indhuhu noo furmaan ayaannu
doonaynaa. 34 Ciise intuu u naxariistay ayuu indhahooda
taabtay oo kolkiiba wax bay arkeen, wayna raaceen.

21 Goortay Yeruusaalem ku soo dhowaadeen oo ay
Beytfaage galeen ilaa Buur Saytuun, markaasaa Ciise
laba xer ah diray, 2 oo wuxuu ku yidhi, Tuulada idinka soo
hor jeedda taga, oo kolkiiba waxaad ka helaysaan dameer
xidhan iyo qayl la jooga. Soo fura oo ii keena, 3 oo haddii nin
wax idinku yidhaahdo, waxaad ku tidhaahdaan, Sayidkaa u
baahan, oo kolkiiba wuu soo diri doonaa. 4 Waxanu waa
dhaceen in la arko wixii nebiga lagaga dhex hadlay markuu
yidhi, 5 Gabadha Siyoon u sheega, Bal eeg, boqorkaagu
waa kuu imanayaa, Isagoo qalbi qabow, oo dameer fuushan
Iyo qayl dameereed. 6 Markaasaa xertii tagtay, oo sida
Ciise ku amray ayay yeeleen. 7 Dameertii iyo qaylkii ayay
keeneen, oo dharkoodii bay dusha ka saareen, wuuna ku
fadhiistay. 8 Dadka badidooda ayaa dharkoodii jidka ku
goglay, qaar kalena laamo ayay geedaha ka soo jareen
oo jidka ku gogleen. 9 Dadkii badnaa oo hor socday iyo
kuwii daba socday waxay ku qayliyeen, Hoosanna ha u jirto
ina Daa'uud. Waxaa barakaysan kan Rabbiga magiciisa ku
imanaya, Hoosanna ha ku jirto meelaha ugu sarreeya. 10
Oo goortuu Yeruusaalem galay, magaalada oo dhan waa
kacsanayd, iyagoo leh, Kanu yuu yahay? 11 Dadkii badnaa
ayaa yidhi, Kanu waa nebiga Ciise la yidhaahdo oo ka yimid
Naasared tii Galili. 12 Ciise wuxuu galay macbudka Ilaah oo
ka eryay kulli kuwii macbudka wax ku iibinayay iyo kuwii wax
ka iibsanayay, oo wuxuuna rogay miisaskii kuwii lacagta
bedbeddelayay iyo kursiyadii kuwii qoolleyaha iibinayay.
13 Wuxuuna ku yidhi, Waa qoran tahay, Gurigayga waxaa
loogu yeedhi doonaa guriga tukashada, laakiin waxaad ka
dhigaysaan god tuugo. 14 Waxaana macbudka ugu yimid
kuwa indha la' iyo kuwa luga la'; wuuna bogsiiyey. 15 Laakiin
wadaaddada sare iyo culimmadu goortay arkeen waxyaalaha
yaabka leh oo uu suubbiyey iyo carruurta macbudka ka
qaylinaysa, iyagoo leh, Hoosanna ha u jirto ina Daa'uud, way
cadhoodeen 16 oo ku yidhaahdeen, Ma maqlaysaa kuwanu
waxay leeyihiin? Ciise ayaa ku yidhi, Haah, miyaydnaan
weligiin akhriyin, Ammaanta waxaad ku hagaajisay afka
ilmaha yaryar iyo caanonuugga? 17 Markaasuu ka tegey
iyaga oo magaaladii ka baxay ilaa Beytaniya, oo halkaasuu
ku hoyday. 18 Aroortii goortuu magaaladii ku soo noqonayay,
wuu gaajaysnaa. 19 Oo wuxuu arkay geed berde ah oo
jidka ku ag yaal, kolkaasuu u yimid, waxbana kama uu
helin, caleemo keliya maahee. Oo wuxuu ku yidhi, Hadda
dabadeed weligaa midho yaanay kaa bixin, oo kolkiiba
geedkii berdaha ahaa waa engegay. **(aiōn g165)** 20 Xertii
goortay arkeen way yaabeen oo waxay ku yidhaahdeen,
Geedkii berdaha ahaa sidee buu kolkiiba u engegay? 21
Ciise ayaa u jawaabay oo ku yidhi, Runtii waxaan idinku
leeyahay, Haddaad rumaysan tihiin oo aydnaan shakiyin, wixii
geedkii berdaha ahaa ku dhacay oo keliya ma aad samayn
doontaan, laakiin weliba haddaad buurtan ku tidhaahdaan,
Ruq, baddana isku tuur, way noqonaysaa. 22 Oo wax
kasta oo aad tukasho ku baridaan idinkoo rumaysan waad
heli doontaan. 23 Oo goortuu macbudkii galay, intuu wax

barayay waxaa u yimid wadaaddadii sare iyo waayeelladii
dadka, oo waxay ku yidhaahdeen, Amarkee baad waxan ku
samaysaa? Oo yaa amarkan ku siiyey? 24 Ciise ayaa u
jawaabay oo ku yidhi, Aniguna hal baan idin weyddiinayaa.
Haddaad taas ii sheegtaan, aniguna waan idiin sheegi
doonaa amarka aan waxan ku sameeyo. 25 Baabtiiskii
Yooxanaa xaggee buu ka yimid? Ma wuxuu ka yimid xagga
jannada mise dadka? Dhexdooda ayay iskala hadleen iyagoo
leh, Haddaynu nidhaahno, Xagga jannada, wuxuu inagu
odhanayaa, Haddaba maxaad u rumaysan weydeen? 26
Laakiin haddii aynu nidhaahno, Xagga dadka, dadka badan
ayaynu ka baqaynaa, waayo, Yooxanaa sida nebi oo kale
ayay kulli u haystaan. 27 Markaasay Ciise u jawaabeen oo
ku yidhaahdeen, Garan mayno. Isaguna wuxuu ku yidhi,
Aniguna idiin sheegi maayo amarka aan waxan ku sameeyo.
28 Maxay idinla tahay? Nin baa laba wiil lahaa. Wuxuu u yimid
kii hore oo ku yidhi, Wiilkaygiiyow, aad beerta canabka ah oo
maanta ka shaqee. 29 Wuxuu u jawaabay oo ku yidhi, Dooni
maayo, laakiin kolkaas dabadeed ayuu isqoomameeyey oo
aaday. 30 Markaasuu wuxuu u yimid kii labaad, oo sidii
oo kale ku yidhi. Isaguna wuxuu u jawaabay oo ku yidhi,
Waa yahay, waan tegayaa, sayidow, laakiin ma uu tegin.
31 Kee baa labadoodii doonistii aabbihiis yeelay? Waxay
yidhaahdeen, Kii hore. Ciise ayaa ku yidhi, Runtii waxaan
idinku leeyahay, Cashuurqaadayaasha iyo dhillooyinka
ayaa idinka hor geli doona boqortooyada Ilaah. 32 Waayo,
Yooxanaa wuxuu idiinku yimid jidka xaqnimada ah, oo waad
rumaysan weydeen isaga, laakiin cashuurqaadayaashii
iyo dhillooyinkii ayaa rumaystay isaga. Idinkuna goortaad
aragteen dabadeed iskama aydnaan qoomamayn si aad u
rumaysataan. 33 Maqla masaal kale. Waxaa jiri jiray nin oday
reer u ah, oo beer canab ah beertay, oo ood ku heeraaray,
dabadeedna god macsareed ka dhex qoday, oo munaarad
ka dhisay, oo niman beerrey ah u kiraystay, oo dal kale
tegey. 34 Oo goortii xilligii midhahu soo dhowaaday ayuu
addoommadiisii u soo diray beerreydii inay midhihiisii u soo
qaadaan. 35 Markaasaa beerreydu addoommadiisii qabatay,
mid way garaaceen, mid kalena way dileen, mid kalena way
dhagxiyeen. 36 Haddana wuxuu diray addoommo kale oo
kuwii hore ka badan, iyagiina sidaas oo kalay ku sameeyeen.
37 Laakiin dabadeed wuxuu u soo diray wiilkiisii isagoo leh,
Wiilkayga way maamuusi doonaan. 38 Laakiin beerreydii
goortay wiilkii arkeen, waxay isku yidhaahdeen, Kanu waa
kii dhaxalka lahaa, kaalaya aan dilnee oo dhaxalkiisa aynu
qaadannee. 39 Way qabteen oo beertii canabka ahayd
dibaddeeda ku tuureen, wayna dileen. 40 Haddaba sayidkii
beerta canabka ah goortuu yimaado, muxuu beerreydaas ku
samayn doonaa? 41 Waxay ku yidhaahdeen, Nimankaas
belaayada ah si baas buu u baabbi'in doonaa; beerta
canabka ahna wuxuu u kiraysan doonaa beerrey kale, kuwa
isaga siin doona midhihiisa xilligooda. 42 Markaasaa Ciise
ku yidhi iyaga, Miyaanaydin weligiin Qorniinka ka akhriyin,
Dhagaxii kuwa wax dhisaa ay diideen, Wuxuu noqday
madaxa rukunka. Tanu xagga Rabbiga bay ka timid, Oo
waa ku yaab indhahayaga? 43 Sidaa darteed waxaan idinku
leeyahay, Boqortooyada Ilaah waa laydinka qaadi doonaa,
oo waxaa la siin doonaa dad midhihii boqortooyada bixiya.
44 Oo kan dhagaxan ku dhacaa, wuu jejebi doonaa, oo kan
uu ku dhaco, wuu burburin doonaa. 45 Wadaaddadii sare iyo
Farrisiintii goortay masaalladiisii maqleen waxay garteen
inuu iyagu ka hadlay. 46 Goortay dooneen inay qabtaan ayay
dadkii badnaa ka baqeen, waayo, waxay u haysteen nebi.

**22** Ciise ayaa u jawaabay oo mar kale masaallo kula
hadlay, oo wuxuu yidhi, 2 Boqortooyada jannada
waxay la mid tahay sidii boqor wiilkiisa aroos u dhigay.
3 Addoommadiisii ayuu u diray inay u yeedhaan kuwa
arooska loogu yeedhay, mana ay doonaynin inay yimaadaan.
4 Haddana addoommo kale ayuu diray oo wuxuu ku
yidhi, Kuwii loo yeedhay waxaad ku tidhaahdaan, Bal
eega, cuntadaydii waan diyaargareeyey, dibiyadaydii iyo
neefafkaygii buurbuurnaana waa la qalay, wax walubana
waa diyar, ee arooska kaalaya. 5 Laakiin way fududaysteen,
oo iska tageen, mid beertiisuu aaday, mid kalena wuxuu
aaday baayacmushtarigiisii. 6 Kuwii kalena addoommadiisii
ayay qabteen, wayna caayeen oo dileen. 7 Laakiin boqorkii
markuu maqlay wuu cadhooday, oo askartiisii buu u diray oo
baabbi'iyey kuwaasoo dhiig qabay, magaaladoodiina wuu
gubay. 8 Markaasuu addoommadiisii ku yidhi, Arooskii waa
diyaar, kuwii loo yeedhayse ma ay istaahilin. 9 Haddaba taga
meesha jidadka ku kala leexdaan, oo in alla intaad heshaan
arooska ugu yeedha. 10 Markaasaa addoommadaas jidadkay
u baxeen, oo ay soo ururiyeen kuwii ay heleen oo dhan, kuwii
sharka lahaa iyo kuwii wanaagsanaaba; gurigii arooskana
waxaa laga buuxiyey marti. 11 Laakiin boqorkii kolkuu
soo galay inuu martida eego, wuxuu meesha ku arkay
nin aan dharkii arooska qabin, 12 oo wuxuu ku yidhi,
Saaxiibow, sidee baad halkan u soo gashay adigoo aan
dharkii arooska qabin? Wuuna iska aamusay. 13 Markaasaa
boqorkii wuxuu midiidinyadii ku yidhi, Lugaha iyo gacmaha
ka xidha, oo gudcurka dibadda ah ku tuura; halkaas waxaa
jiri doonta baroor iyo ilko jirriqsi. 14 Waayo, kuwo badan
baa loo yeedhay, laakiin kuwo yar baa la doortay. 15
Markaasaa Farrisiintii baxeen, oo waxay ka wada hadleen

si ay hadalkiisa ugu qabtaan. **16** Waxay xertoodii ula soo
direen Herodosiinta, oo waxay ku yidhaahdeen, Macallimow,
waannu og nahay inaad run tahay, oo aad dadka jidka
Ilaah run ku bartid, oo aanad ninna u eexan, waayo, dadka
wejigooda ma eegtid. **17** Haddaba noo sheeg waxay kula
tahay, Ma xalaal baa in cashuur Kaysar la siiyo ama inaan la
siin? **18** Laakiin Ciise ayaa sharkoodii gartay, oo wuxuu ku
yidhi, Maxaad ii jirrabaysaan, labawejiilayaal yahow? **19** I tusa
lacagta cashuurta. Kolkaasay u keeneen dinaar. **20** Wuxuu
ku yidhi, Yaa leh masawirkan iyo qorniinkan? **21** Waxay ku
yidhaahdeen, Kaysar baa leh. Markaasuu ku yidhi, Haddaba
Kaysar siiya wixii Kaysar leeyahay, Ilaahna siiya wixii Ilaah
leeyahay. **22** Oo goortay taas maqleen, way yaabeen, wayna
iska daayeen oo ka tageen. **23** Maalintaas waxaa u yimid
Sadukiin kuwii odhan jiray, Sarakicidda kuwii dhintay ma jirto.
Oo waxay weyddiiyeen, **24** oo ku yidhaahdeen, Macallimow,
Muuse wuxuu yidhi, Haddii nin dhinto isagoo aan carruur
lahayn, walaalkiis waa inuu naagtiisa dumaalo oo uu carruur
walaalkiis u dhalo. **25** Waxaa nala jiray toddoba walaalo ah.
Kii ugu horreeyey ayaa guursaday, wuuna dhintay, dhalna
ma lahayn, wuxuuna naagtiisii uga tegey walaalkiis. **26**
Sidaas oo kalaa ku dhacday kii labaad, iyo kii saddexaad ilaa
kii toddobaad. **27** Markay wada dhinteen dabadeed naagtiina
waa dhimatay. **28** Haddaba wakhtiga sarakicidda kuwii
dhintay toddobadoodii kee bay naagtiisii ahaan doontaa?
Waayo, kulligood way wada guursadeen iyada. **29** Laakiin
Ciise ayaa u jawaabay oo ku yidhi, Waad qaldan tihiin oo
garan maysaan Qorniinka iyo xoogga Ilaah. **30** Waayo,
wakhtiga sarakicidda kuwii dhintay dabadeed, layskuma
guursado, guurna layskuma siiyo, laakiin waxay yihiin sida
malaa'igaha Ilaah oo jannada ku jira. **31** Laakiin xagga
sarakicidda kuwii dhintay miyaydnaan akhriyin wixii Ilaah
idinkula hadlay, markuu yidhi, **32** Anigu waxaan ahay Ilaaha
Ibraahim iyo Ilaaha Isxaaq iyo Ilaaha Yacquub? Isagu ma
aha Ilaaha kuwa dhintay, laakiin waa Ilaaha kuwa nool. **33**
Dadkii badnaa goortay taas maqleen ayay waxbariddiisii
ka yaabeen. **34** Laakiin Farrisiintii goortay maqleen inuu
Sadukiintii aamusiiyey ayay isu yimaadeen. **35** Oo midkood
oo sharciga yaqaan ayaa wax weyddiiyey, isagoo jirrabaya,
oo wuxuu ku yidhi, **36** Macallimow, qaynuunkee baa sharciga
uga weyn? **37** Kolkaasuu ku yidhi isaga, Waa inaad Rabbiga
Ilaahaaga ah ka jeclaataa qalbigaaga oo dhan iyo naftaada
oo dhan iyo caqligaaga oo dhan. **38** Kanu waa qaynuunka
ugu weyn oo ugu horreeya. **39** Ku labaad oo u ekina waa
kan. Waa inaad deriskaaga u jeclaataa sida naftaada. **40**
Sharcigii oo dhan iyo nebiyadiiba waxay sudhan yihiin
labadan qaynuun. **41** Kolkii Farrisiintii isu yimaadeen ayaa
Ciise wax weyddiiyey, **42** oo wuxuu ku yidhi, Yuu idinla
yahay Masiixu? Waa ina ayo? Kolkaasay ku yidhaahdeen,
Waa ina Daa'uud. **43** Wuxuu ku yidhi, Haddaba Daa'uud
sidee buu Ruuxa ugaga yeedhay Rabbi? isagoo leh, **44**
Rabbigu wuxuu Sayidkayga ku yidhi, Midigtayda fadhiiso,
Ilaa aan cadaawayaashaada cagahaaga hoostooda geliyo.
**45** Haddaba Daa'uud hadduu ugu yeedhay isaga Sayid,
sidee buu wiilkiisa u yahay? **46** Ninna hadal uguma jawaabi
karin, oo maalintaas dabadeed ninna kuma dhicin inuu mar
dambe wax weyddiiyo.

**23** Dabadeed Ciise ayaa dadkii badnaa iyo xertiisii la
hadlay, **2** oo wuxuu ku yidhi, Culimmada iyo Farrisiinta
waxay ku fadhiistaan kursiga Muuse. **3** Haddaba wax walba
oo ay idiin sheegaan inaad dhawrtaan, dhawra oo yeela,
laakiin siday sameeyaan ha samaynina, waayo, wax bay
yidhaahdaan, mana sameeyaan. **4** Waxay isku xidhxidhaan
culaabo culculus oo waxay saaraan dadka garbihiisa, laakiin
iyagu dooni maayaan inay fartooda ku dhaqaajiyaan. **5**
Laakiin shuqulkooda oo dhan waxay u sameeyaan in dadku
arko, waayo, xirsiyadooda way ballaadhiyaan, oo faraqa
dharkoodana way weyneeyaan; **6** waxay jecel yihiin meelaha
hore oo diyaafadaha, iyo kursiyada hore oo sunagogyada, **7**
iyo salaanta suuqa, iyo in dadku ugu yeedhaan, Macallin. **8**
Laakiin yaan laydiinku yeedhin, Macallin, waayo, mid baa
macallinkiinna ah, idinkuna kulli walaalo baad tihiin. **9** Ninna
dhulka ha ugu yeedhina aabbe, waayo, mid baa Aabbihiin
ah, kaasu waa kan jannada ku jira. **10** Yaan laydiinku yeedhin
sayiddo, waayo, mid baa sayidkiinna ah, kaasu waa Masiixa.
**11** Laakiin kan idiinku weyn waa inuu ahaado midiidinkinna.
**12** Oo ku alla kii isa sarraysiiya waa la hoosaysiin doonaa,
oo ku alla kii is-hoosaysiiyana waa la sarraysiin doonaa.
**13** Laakiin waa idiin hoog, culimmo iyo Farrisiin yahay oo
labawejiilayaasha ahu, waayo, boqortooyada jannada ayaad
dadka ka xidhaan, maxaa yeelay, idinku ma gashaan, oo
kuwa gelayana uma deysaan inay galaan. **14** Waa idiin hoog,
culimmo iyo Farrisiin yahay, labawejiilayaasha ahu, waayo,
waxaad laasataan guryaha carmallada, oo tukashooyin
dhaadheer ayaad istusid u tukataan, sidaa darteed waxaad
heli doontaan xisaab aad u daran. **15** Waa idiin hoog,
culimmo iyo Farrisiin yahay, labawejiilayaasha ahu, waayo,
badda iyo dhulka waxaad u wareegtaan inaad mid soo
hadaysaan, oo kolkuu sidaas noqdo, waxaad ka dhigtaan
wiilka jahannamada laba kol in idinka badan idinka. **(Geenna
g1067)** **16** Waa idiin hoog, hoggaamiyayaal yahow indhaha
la'u oo leh, Ku alla kii macbudka ku dhaarta, waxba ma aha,
laakiin ku alla kii dahabkii macbudka ku dhaarta, wuxuu ku

dhaartay waa lagu leeyahay. 17 Doqonno yahow indhaha
la'u, kee baa weyn, dahabka iyo macbudka dahabka quduus
ka dhiga? 18 Oo weliba waxaad leedihiin, Ku alla kii meesha
allabariga ku dhaarta waxba ma aha, laakiin ku alla kii ku
dhaarta hadiyadda dul saaran, wuxuu ku dhaartay waa lagu
leeyahay. 19 Indhoolayaal yahow, haddaba kee baa weyn,
hadiyadda iyo meesha allabariga oo hadiyadda quduus ka
dhigta? 20 Haddaba kan meesha allabariga ku dhaartaa,
wuxuu ku dhaartaa iyada iyo wixii dul saaran oo dhanba. 21
Oo kii macbudka ku dhaartaa, wuxuu ku dhaartaa isaga iyo
kan dhex degganba. 22 Oo kii jannada ku dhaartaana, wuxuu
ku dhaartaa carshiga Ilaah iyo kan ku dul fadhiyaba. 23 Waa
idiin hoog, culimmo iyo Farrisiin yahay, labawejiilayaasha
ahu, waayo, reexaanta iyo kabsarta iyo kamuunta toban
meelood ayaad meel ka bixisaan, oo waxaad dhaafteen wixii
sharciga ugu cuslaa, waxaa weeye xukunka iyo naxariista
iyo iimaanka. Waxaad lahaydeen inaad waxan samaysaan
oo aydnaan kuwa kale dhaafin. 24 Hoggaamiyayaal yahow
indhaha la'u oo kaneecada iska miira oo awrka liqa. 25 Waa
idiin hoog, culimmo iyo Farrisiin yahay, labawejiilayaasha
ahu, waayo, koobka iyo saxanka dushaad ka nadiifisaan,
laakiin gudaha waxaa ka buuxa dulun iyo damacbadnaan.
26 Farrisi yahow indhaha la'u, horta koobka gudaha ka nadiifi
in dushiisuna nadiifsanaato. 27 Waa idiin hoog, culimmo iyo
Farrisiin yahay, labawejiilayaasha ahu, waayo, waxaad u eg
tihiin xabaalo la caddeeyey, kuwa dushoodu u eg tahay wax
qurxoon, laakiin hoosta waxaa ka buuxa lafo dad dhintay
iyo wasakh oo dhan. 28 Sidaas oo kalena idinku dusha
waxaad dadka ugu eg tihiin dad xaq ah, laakiin gudaha
waxaa idinka buuxa labawejiilenimo iyo dembi. 29 Waa
idiin hoog, culimmo iyo Farrisiin yahay, labawejiilayaasha
ahu, waayo, waxaad dhistaan xabaalaha nebiyada, oo
waxaad qurxisaan qabriyada kuwii xaqa ahaa; 30 oo waxaad
tidhaahdaan, Haddii aannu waagii awowayaashayo joogi
lahayn, annagu kala ma aannan qayb galneen kuwii dhiigga
nebiyada qabay. 31 Sidaasaad isugu marag furaysaan
inaad tihiin wiilasha kuwii nebiyada dilay. 32 Idinku haddaba
dhammaystira qiyaastii awowayaashiin. 33 Abeesooyin
yahow, dhal jilbisay, sidee baad uga baxsan doontaan
xisaabta jahannamada? **(Geenna g1067)** 34 Sidaa darteed,
waxaan idiin soo dirayaa nebiyo iyo kuwa xigmadda leh
iyo culimmo. Qaarkood waad dili doontaan oo iskutallaabta
ku qodbi doontaan, qaarkoodna sunagogyadiinna ayaad
ku karbaashi doontaan, oo magaalo ilaa magaalo ayaad
ku silcin doontaan, 35 inuu dushiinna ku soo dego dhiiggii
xaqa ahaa oo dhulka ku daatay oo dhan oo laga bilaabo
dhiigga Haabiil kii xaqa ahaa ilaa dhiigga Sakariyas ina
Barakiyas kan aad ku disheen meesha quduuska ah iyo
meeshii allabariga dhexdooda. 36 Runtii waxaan idinku
leeyahay, Waxyaalahan oo dhan ayaa qarnigan ku dul degi
doona. 37 Yeruusaalemay, Yeruusaalemay, tan nebiyada
dishoy oo kuwa loo soo diray dhagxisoy! Intee baan marar
badan jeclaaday inaan carruurtaada u soo ururiyo xataa sida
dooradu carruurteeda baalasheeda hoostooda ugu ururiso,
laakiin idinku ma aydnaan jeclayn. 38 Bal eega, gurigiinnii
waa laydiin daayay isagoo cidla ah. 39 Waayo, waxaan
idinku leeyahay, Ima arki doontaan hadda dabadeed ilaa
aad tidhaahdaan, Waxaa barakaysan kan Rabbiga magiciisa
ku imanaya.

**24** Ciise ayaa macbudka ka baxay, oo intuu tegayay ayaa
xertiisii u timid inay tusaan dhismaha macbudka. 2
Laakiin wuu u jawaabay oo wuxuu ku yidhi, Miyaydnaan
waxyaalahan oo dhan arkaynin? Runtii waxaan idinku
leeyahay, Halkan lagu dul dayn maayo dhagax dhagax
kale dushiisa oo aan la dumin doonin. 3 Oo goortuu Buur
Saytuun fadhiistay, xertii ayaa keli ahaan ugu timid oo waxay
ku yidhaahdeen, Noo sheeg, Goormay waxyaalahanu ahaan
doonaan, oo calaamada imaatinkaaga iyo dhammaadka
wakhtiga dunidu maxay ahaan doontaa? **(aiōn g165)** 4 Ciise
ayaa u jawaabay oo wuxuu ku yidhi, Iska eega yaan laydin
khiyaanayn. 5 Waayo, qaar badan ayaa magacayga ku
iman doona, oo waxay odhan doonaan, Anigu waxaan ahay
Masiixa, oo qaar badan ayay khiyaanayn doonaan. 6 Oo
waxaad maqli doontaan dagaallo iyo dagaallo hadalhayntood.
Iska jira, hana baqanina, waayo, waxaasu waa inay dhacaan,
laakiin dhammaadku weli weeye. 7 Waayo, quruunba quruun
bay ku kici doontaa, boqortooyona boqortooyo, oo waxaa
meelo kala duwan ka dhici doona abaaro iyo dhulgariir. 8
Waxan oo dhammu waa bilowga hoogagga. 9 Markaasaa
dhib laydiin gaysan doonaa, waana laydin dili doonaa,
oo magacayga aawadiis ayaa quruumaha oo dhammi
idiin nebcaan doonaan. 10 Maarkaas qaar badan ayaa
xumaan doona, midba mid buu gacangelin doonaa, wayna
isnebcaan doonaan. 11 Waxaa kici doona nebiyo badan
oo been ah, oo qaar badan ayay khiyaanayn doonaan. 12
Dembigu waa badnaan doonaa, taa aawadeed qaar badan
jacaylkoodu waa yaraan doonaa. 13 Laakiin kii adkaysta ilaa
ugu dambaysta, kaasaa badbaadi doona. 14 Oo injiilkan
boqortooyada ayaa dunida oo dhan lagu wacdiyi doonaa
inuu marag u noqdo Quruumaha oo dhan, dabadeedna
ugudambaysta ayaa iman doonta. 15 Haddaba goortaad
aragtaan waxa baas oo hallaynta ah ee lagaga hadlay nebi
Daanyeel, oo taagan meesha quduuska ah (kii akhriyaa

ha garto), 16 markaas kuwa Yahuudiya joogaa, buuraha
ha u carareen. 17 Kii guri fuushanuna yaanu u soo degin
inuu wixii gurigiisa ku jira soo qaato. 18 Kii beerta joogaana
yaanu dib ugu noqon inuu dharkiisa soo qaato. 19 Laakiin
waa u hoog kuwa uurka leh iyo kuwa wakhtigaas ilmo
nuujinaya. 20 Barya inaan cararkiinnu noqon wakhtiga
qabowga ama sabtida. 21 Waayo, markaas waxaa jiri doona
dhib weyn sida mid aan jirin tan iyo dunida bilowgeedii
ilaa hadda, mana jiri doonto weligeed. 22 Oo haddaan
wakhtigaas la gaabin ninna ma uu badbaadeen, laakiin kuwa
la doortay aawadood ayaa wakhtigaas loo gaabin doonaa. 23
Maarkaas haddii laydinku yidhaahdo, Waa kan Masiixa ama
waa kaas, ha rumaysanina. 24 Waayo, waxaa kici doona
Masiixyo been ah iyo nebiyo been ah, oo waxay samayn
doonaan calaamooyin waaweyn iyo yaabab, si ay xataa
kuwa la doortay u khiyaaneeyaan hadday u suurtowdo. 25
Bal eega, horaan idiinku sheegaye. 26 Haddaba hadday
idinku yidhaahdaan, Bal eega, wuxuu joogaa cidlada, ha
u bixina. Bal eega, wuxuu joogaa qolalka qarsoon, ha
rumaysanina. 27 Waayo, sida hillaacu bari uga yimaado
oo u ifiyo galbeed, sidaas oo kale ayaa imaatinka Wiilka
Aadanahu ahaan doonaa. 28 Meel alla meeshii bakhtigu
yaal, halkaas ayaa gorgorraduna isugu ururi doonaan. 29
Laakiin dhibta wakhtigaas dabadeed, kolkiiba qorraxdu
waa madoobaan doontaa, dayuxuna ma nuuri doono,
xiddiguhuna cirka waa ka soo dhici doonaan, xoogagga
cirkana waa la gariirin doonaa. 30 Markaasaa waxaa cirka ka
soo muuqan doona calaamada Wiilka Aadanaha, markaas
ayaa qolooyinka dhulka oo dhammu barooran doonaan, oo
waxay arki doonaan Wiilka Aadanaha oo daruuraha cirka ku
imanaya isagoo leh xoog iyo ammaan weyn. 31 Oo wuxuu
soo diri doonaa malaa'igihiisa oo wata buun weyn, oo kuwuu
doortay ayay ka soo ururin doonaan afarta jahood cirka
meesha ugu fog ilaa meesheeda kale. 32 Haddeer geedka
berdaha ah masaal ka garta. Intii laantiisu curdan tahay
oo caleemo bixinayso, waxaad garanaysaan inuu roobku
dhow yahay. 33 Idinkuna sidaas oo kale goortaad waxan
oo dhan aragtaan, garta inuu dhow yahay oo albaabbada
ag joogo. 34 Runtii waxaan idinku leeyahay, Qarniganu ma
idlaan doono intaanay waxan oo dhammi dhicin. 35 Cirka
iyo dhulku waa idlaan doonaan, laakiinse ereyadaydu ma
idlaan doonaan. 36 Laakiin maalintaas iyo saacaddaas ninna
waxba kama oga, malaa'igaha jannada iyo Wiilka toona,
midna ma oga, Aabbahay keliya maahee. 37 Sida wakhtigii
Nuux ahaa, sidaas oo kale ayaa imaatinka Wiilka Aadanahu
ahaan doonaa. 38 Waayo, siday wax u cunayeen oo wax
u cabbayeen, oo u guursanayeen oo loogu guurinayay
maalmihii daadka hortiisa ilaa maalintii Nuux doonnida galay,
39 wayna garan waayeen ilaa daadkii yimid oo kulligood wada
qaaday, sidaas oo kale ayaa imaatinka Wiilka Aadanahu
ahaan doonaa. 40 Markaas laba nin ayaa beerta ku jiri doona,
mid waa la qaadi doonaa, midna waa laga tegi doonaa. 41
Laba naagood ayaa dhagax wax ku shiidi doona, mid waa la
qaadi doonaa, midna waa laga tegi doonaa. 42 Haddaba soo
jeeda, waayo, ma aad ogidin maalinta Rabbigiinnu imanayo.
43 Laakiin tan ogaada, odayga reerku hadduu ogaan lahaa
wakhtiga tuuggu imanayo, wuu soo jeedi lahaa, oo ma uu
daayeen in gurigiisa la jebiyo. 44 Sidaa darteed idinkuna
diyaar ahaada, waayo, saacad aydnaan u malaynaynin
ayaa Wiilka Aadanahu imanayaa. 45 Haddaba yuu yahay
addoonka aaminka ah oo caqliga leh, kan sayidkiisu dadka
gurigiisa u sarreeysiiyey inuu cuntada siiyo wakhtigeeda?
46 Waxaa barakaysan addoonkaas kan sayidkiisu goortuu
yimaado uu helayo isagoo sidaas samaynaya. 47 Runtii
waxaan idinku leeyahay, Wuxuu leeyahay oo dhan ayuu ka
sarreeysiin doonaa isaga. 48 Laakiin haddii addoonkaas
sharka leh qalbigiisa ka yidhaahdo, Sayidkaygu waa raagay,
49 oo uu bilaabo inuu garaaco kuwii la shaqayn jiray, oo
uu wax la cuno oo wax la cabbo kuwa sakhraanka ah, 50
addoonkaas sayidkiisu wuxuu iman doonaa maalin aanu
filayn iyo saacad aanu ogayn, 51 oo waa kala jeexi doonaa oo
wuxuu ka dhigi doonaa mid qayb la hela labawejiilayaasha.
Halkaa waxaa jiri doonta baroor iyo ilko jirriqsi.

**25** Haddaba boqortooyada jannada waxaa loo ekaysiin
doonaa toban gabdhood oo bikrado ah, kuwa intay
laambadahooda qaateen, u baxay inay ninka arooska ah
ka hor tagaan. 2 Shantood waxay ahaayeen doqonno,
shanna caqli bay lahaayeen. 3 Kuwii doqonnada ahaa
laambadahoodii bay qaateen, laakiin saliid ma ay qaadan.
4 Kuwa caqliga lahaase laambadahoodii bay qaateen
iyo weelal saliidu ku jirto. 5 Laakiin ninkii arooska ahaa
waa raagay, taas daraaddeed ayay wada lulmoodeen oo
seexdeen. 6 Habeenbadhkiise qaylo ayaa yeedhay, Arooskii
waa soo socdaaye, soo baxa oo ka hor taga. 7 Markaasaa
bikradihii oo dhammu wada kaceen oo laambadahoodii
hagaajiyeen. 8 Kuwii doqonnada ahaa waxay kuwii caqliga
lahaa ku yidhaahdeen, Saliiddiinna wax naga siiya, waayo,
laambadahayagii waa demayaan. 9 Laakiin kuwii caqliga
lahaa ayaa u jawaabay oo waxay ku yidhaahdeen, Maya,
waaba intaas oo ay nagu filnaan waydaa annaga iyo idinka;
bal u taga kuwa iibiya oo ka soo iibsada. 10 Markay tageen
inay soo iibsadaan, ninkii arooska ahaa ayaa yimid, oo kuwii
diyaarka ahaa ayaa la galay guriga arooska, albaabkiina

waa la xidhay. 11 Dabadeedna waxaa yimid bikradihii kale,
oo waxay yidhaahdeen, Sayidow, Sayidow, naga fur. 12
Laakiin wuu u jawaabay oo ku yidhi, Runtii waxaan idinku
leeyahay, Anigu idin garan maayo. 13 Haddaba soo jeeda,
waayo, garan maysaan maalinta ama saacadda. 14 Maxaa
yeelay, waa sidii nin dal kale tegaya, oo addoommadiisii
u yeedhay oo xoolihiisii u dhiibay. 15 Mid wuxuu siiyey
shan talanti, midna wuxuu siiyey laba, midna wuxuu siiyey
mid; mid kasta sidii tabartiisu ahayd, markaasuu dhoofay.
16 Isla markiiba kii shantii talanti helay ayaa tegey oo ku
baayacmushtaray, oo wuxuu faa'iiday shan talanti oo kale.
17 Sidaas oo kale kii labada helayna, laba kale ayuu faa'iiday.
18 Kii midka helayse, wuu baxay oo dhulka qoday oo lacagtii
sayidkiisii ayuu ku qariyey. 19 Wakhti dheer dabadeed
sayidkii addoommadaas ayaa yimid oo ka xisaab qaatay. 20
Kii shantii talanti helay ayaa yimid oo keenay shan talanti
oo kale, oo wuxuu ku yidhi, Sayidow, waxaad ii dhiibtay
shan talanti; eeg, shan talanti oo kale ayaan ka faa'iiday.
21 Sayidkiisii ayaa ku yidhi, Si wanaagsan baad yeeshay,
addoon yahow wanaagsan oo aaminka ahu. Wax yar ayaad
aamin ku ahayd, wax badan baan madax kaaga dhigayaa.
Farxadda sayidkaaga gal. 22 Kii labadii talanti helayna waa
yimid oo yidhi, Sayidow, waxaad ii dhiibtay laba talanti;
eeg, laba talanti oo kale ayaan ka faa'iiday. 23 Sayidkiisii
ayaa ku yidhi, Si wanaagsan baad yeeshay, addoon yahow
wanaagsan oo aaminka ahu. Wax yar ayaad aamin ku
ahayd, wax badan baan madax kaaga dhigayaa. Farxadda
sayidkaaga gal. 24 Kii talantigii keliya helayna waa u yimid
oo ku yidhi, Sayidow, waan ku garanayay inaad tahay nin
qalbi engegan, oo aad wax ka guratid meel aanad wax
ku beeran oo aad wax ka urursatid meel aanad wax ku
firdhin. 25 Waana baqay, oo intaan tegey ayaan talantigaagii
dhulka ku qariyey. Bal eeg, waa kan kaagii. 26 Markaasaa
sayidkiisii u jawaabay oo ku yidhi, Addoon yahow sharka
leh oo caajiska ahu, waad ogayd inaan wax ka gurto meel
aanan wax ku beeran, oo aan wax ka urursado meel aanan
wax ku firdhin. 27 Haddaba waxaad lahayd inaad lacagtayda
u dhiibto kuwa baangiga jooga, oo goortaan soo noqdo,
waxayga iyo faa'iido ayaan qaadan lahaa. 28 Haddaba
talantigii ka qaada oo u dhiiba kan tobanka talanti haya.
29 Waayo, mid walba oo wax haysta waa la siin doonaa,
waana loo badin doonaa, kii aan waxba haysanse waa laga
qaadi doonaa xataa wuxuu haysto. 30 Oo addoonka aan
waxtarka lahayn ku tuura gudcurka dibadda ah. Halkaas
waxaa jiri doonta baroor iyo ilko jirriqsi. 31 Goortii Wiilka
Aadanahu ammaantiisa ku yimaado, isaga iyo malaa'igaha
oo dhan, markaasuu carshiga ammaantiisa ku fadhiisan
doonaa. 32 Quruumaha oo dhan ayaa hortiisa lagu soo
ururin doonaa oo wuxuu u kala sooci doonaa mid mid sida
adhijirku u kala sooco idaha iyo riyaha. 33 Idaha wuxuu
joojin doonaa midigtiisa, riyahana bidixdiisa. 34 Markaasaa
Boqorku kuwa midigtiisa jooga ku odhan doonaa, Kaalaya,
kuwa Aabbahay barakeeyeyow, oo dhaxla boqortooyada
tan iyo aasaaskii dunida laydiin diyaargareeyey. 35 Waayo,
waan gaajooday oo cuntaad i siiseen, waan harraadsanaa
oo waad i waraabiseen, qariib baan ahaa oo waad i soo
dhoweeyseen, 36 waan qaawanaa oo dhar baad i huwiseen,
waan bukay oo waad i soo booqateen, xabsi baan ku jiray oo
waad ii timaadeen. 37 Markaasaa kuwa xaqa ahu u jawaabi
doonaan iyagoo leh, Sayidow, goormaannu ku aragnay
adigoo gaajaysan oo aannu cunto ku siinnay, ama adigoo
harraadsan oo aannu ku waraabinnay? 38 Goormaannu ku
aragnay adigoo qariib ah oo aannu ku soo dhowaynay ama
adigoo qaawan oo aannu wax ku huwinnay? 39 Goormaannu
ku aragnay adigoo buka ama adigoo xabsi ku jira oo aannu
kuu nimid? 40 Markaasaa Boqorkii u jawaabi doonaa oo ku
odhan doonaa, Runtii waxaan idinku leeyahay, In alla intaad
u samayseen mid ka mid ah walaalahaygan u yaryar, waad
ii samayseen. 41 Markaasuu kuwa bidixdiisa jooga ku odhan
doonaa, Kuwa yahow inkaaranu, iga taga oo gala dabka
weligiis ah kan Ibliiska iyo malaa'igihiisa loo diyaargareeyey.
**(aiōnios g166)** 42 Waayo, waan gaajooday, cuntona ima
aydnaan siin, waan harraadsanaa, imana aydnaan waraabin.
43 Qariib baan ahaa, imana aydnaan soo dhowayn, waan
qaawanaa, dharna ima aydnaan huwin, waanan bukay oo
xabsi ku jiray oo ima aydnaan soo booqan. 44 Iyaguna
markaasay u jawaabi doonaan oo ku odhan doonaan,
Sayidow, goormaannu ku aragnay adigoo gaajaysan ama
harraadsan ama qariib ah ama qaawan ama buka ama
xabsi ku jira oo aannu ku kalmayn waynay? 45 Markaasuu
u jawaabi doonaa oo ku odhan doonaa, Runtii waxaan
idinku leeyahay, In alla intaad u samayn weydeen mid ka
mid ah kuwan u yaryar, anigana waad ii samayn weydeen.
46 Kuwanuna waxay geli doonaan taqsiirta weligeed ah,
kuwa xaqa ahuse waxay geli doonaan nolosha weligeed ah.
**(aiōnios g166)**

**26** Waxaa dhacay goortii Ciise hadalladan oo dhan
dhammeeyey, inuu xertiisii ku yidhi, 2 Waxaad og tihiin
laba maalmood dabadeed inay tahay Iiddii Kormaridda, oo
Wiilka Aadanaha waxaa loo gacangelinayaa in iskutallaabta
lagu qodbo. 3 Markaasaa wadaaddadii sare iyo waayeelladii
dadka waxay isku urursadeen barxadda wadaadkii sare oo
Kayafas la odhan jiray. 4 Oo waxay ka wada hadleen si

ay Ciise khiyaano ugu qabtaan oo ay u dilaan. 5 Laakiin
waxay yidhaahdeen, Yaanay noqon wakhtiga iidda si aan
rabshad dadka uga dhex kicin. 6 Ciise goortuu Beytaniya
joogay oo ku jiray guriga Simoon kii baraska qabi jiray, 7
waxaa u timid naag haysa weel alabastar ah oo cadar qaali
ah ku jiro, oo waxay ku shubtay madaxiisa intuu cuntada u
fadhiyey. 8 Laakiin xertu goortay arkeen, way cadhoodeen
oo waxay yidhaahdeen, Khasaaradanu maxay ku noqotay?
9 Waayo, kan waxaa lagu iibin kari lahaa wax badan oo
masaakiinta la siin lahaa. 10 Ciise goortuu gartay ayuu ku
yidhi, Maxaad naagta u dhibaysaan? Shuqul wanaagsan
ayay igu samaysaye. 11 Waayo, masaakiintu mar walba
way idinla jiraan, aniguse mar walba idinlama joogo. 12
Waxay cadarkan jidhkayga ugu shubtay inay aasniintayda ii
diyaargarayso. 13 Runtii waxaan idinku leeyahay, Dunida
oo dhan meel alla meeshii injiilkan lagu wacdiyo, waxay
samaysay ayaa xusuusteeda lagaga hadli doonaa. 14
Markaas mid laba-iyo-tobankii ka mid ahaa oo Yuudas
Iskariyod la odhan jiray ayaa u tegey wadaaddada sare 15
oo ku yidhi, Maxaad doonaysaan inaad i siisaan? Anna waan
idiin soo gacangelin doonaaye. Oo waxay bixiyeen soddon
gogo' oo lacag ah. 16 Markaas dabadeed wuxuu doonayay
goor wanaagsan oo uu u soo gacangeliyo. 17 Maalintii
ugu horraysay oo Iiddii Kibistii aan khamiirka lahayn xertii
ayaa Ciise u timid oo waxay ku yidhaahdeen, Xaggee baad
doonaysaa inaannu kuu diyaargarayno inaad cuntid cashada
Iidda Kormaridda? 18 Wuxuu yidhi, Magaalada gala oo
hebel u taga oo waxaad ku tidhaahdaan, Macallinkii wuxuu
leeyahay, Wakhtigaygii waa dhow yahay, gurigaaga ayaan
cashada Iidda Kormaridda kula samaysanayaa xertayda. 19
Xertii waa samaysay sida Ciise ku amray oo cashada Iidda
Kormariddii ayay diyaargareeyeen. 20 Goortii makhribkii
la gaadhay, laba-iyo-tobankii xerta ahaa ayuu cunto ula
fadhiistay, 21 oo intay wax cunayeen ayuu ku yidhi, Runtii
waxaan idinku leeyahay, Midkiin ayaa i gacangelin doona.
22 Markaasay aad iyo aad u caloolxumaadeen, oo waxay
bilaabeen in mid kastaa ku yidhaahdo, Ma aniga baa,
Sayidow? 23 Wuu u jawaabay oo wuxuu ku yidhi, Kii saxanka
gacanta ila gesha kaasaa i gacangelin doona. 24 Wiilka
Aadanahu waa baxayaa, siday u qoran tahay, laakiin hoog
waxaa leh ninkaas Wiilka Aadanaha gacangelinaya. Waxaa
ninkaas u wanaagsanaan lahayd inaanu dhalan. 25 Yuudas
oo ah kii gacangeliyey ayaa u jawaabay oo ku yidhi, Ma aniga
baa, Sayidow? Wuxuu ku yidhi, Waad tidhi. 26 Oo intay wax
cunayeen, Ciise ayaa kibis qaaday oo barakeeyey, wuuna
jejebiyey oo xertii siiyey oo yidhi, Qaata oo cuna. Tanu waa
jidhkaygiiye. 27 Kolkaasuu koobkii qaaday oo mahadnaqay
oo siiyey iyaga, oo wuxuu ku yidhi, Kulligiin ka cabba. 28
Waayo, kanu waa dhiiggayga axdiga cusub kan kuwo badan
loo daadshay dembidhaafkooda aawadiis. 29 Laakiin waxaan
idinku leeyahay, Hadda dabadeed anigu kama cabbi doono
midhahan geedka canabka ah ilaa maalinta aan iyadoo
cusub idinkula cabbayo boqortooyada Aabbahay dhexdeed.
30 Goortay gabay ammaan ah ku gabyeen waxay u baxeen
Buur Saytuun. 31 Markaasaa Ciise wuxuu ku yidhi, Caawa
kulligiin waa iga xumaan doontaan, waayo, waxaa qoran,
Adhijirkaan dili doonaa oo idaha foofka ahu waa kala firdhi
doonaan. 32 Laakiin markii kuwii dhintay layga sara kiciyo,
dabadeed ayaan Galili hortiin tegi doonaa. 33 Laakiin Butros
ayaa u jawaabay oo ku yidhi, Hadday kulli kaa xumaadaan,
anigu weligay kaa xumaan maayo. 34 Ciise wuxuu ku yidhi,
Runtii waxaan kugu leeyahay, Caawa qudheeda intaan
diiqu ciyin, saddex kol ayaad i dafiri doontaa. 35 Butros
wuxuu ku yidhi, In kastoo aan leeyahay inaan kula dhinto,
kolleyba ku dafiri maayo. Xertii oo dhammuna sidaasay
wada yidhaahdeen. 36 Markaasaa Ciise la yimid iyaga
meel Getsemane la odhan jiray, oo wuxuu xertii ku yidhi,
Halkan fadhiista intii aan halkaas tegayo oo ku soo tukanayo.
37 Oo wuxuu watay Butros iyo labada wiil oo Sebedi, oo
wuxuu bilaabay inuu calool xumaado oo tiiraanyoodo. 38
Markaasuu ku yidhi, Naftaydu aad bay u calool xun tahay tan
iyo dhimasho; halkan jooga oo ila soo jeeda. 39 Waxoogaa
ayuu hore u socday, oo wejigiisuu u dhacay oo tukaday
isagoo leh, Aabbow, hadday suurtowdo, koobkanu ha i
dhaafo, hase ahaatee, yaanay noqon sidaan doonayo laakiin
sidaad doonaysid ha noqoto. 40 Xertii ayuu u yimid, oo
wuxuu arkay iyagoo hurda, oo wuxuu Butros ku yidhi, Waa
sidee? Miyaad kari weydeen inaad saacad keliya ila soo
jeeddaan? 41 Soo jeeda oo tukada inaydnaan jirrabaadda
gelin. Ruuxu waa diyaar, laakiin jidhku waa itaal daranyahay.
42 Haddana mar labaad ayuu tegey oo tukaday isagoo leh,
Aabbow, haddii aanay suurtoobin in koobkanu i dhaafo
anigoo cabba maahee, sidaad doonaysid ha noqoto. 43 Mar
kale ayuu yimid oo arkay iyagoo hurda, waayo, indhahoodu
lulmay la cuslaayeen. 44 Wuu iska daayay oo haddana ka
tegey, oo mar saddexaad ayuu tukaday isagoo haddana
hadalkii oo kale ku hadlaya. 45 Markaasuu xertii u yimid
oo ku yidhi, Hadda seexda oo nasta. Bal eega, saacaddii
waa dhow dahay, oo Wiilka Aadanaha ayaa dembilayaal loo
gacangelinayaa. 46 Kaca aan tagnee. Eega, kii i gacangelin
lahaa waa soo dhow yahay. 47 Oo intuu weli hadlayay
ayaa Yuudas oo laba-iyo-tobankii ka mid ahaa yimid, isaga
iyo dad aad u badan oo seefo iyo ulo sita. Waxay ka
yimaadeen wadaaddada sare iyo waayeellada dadka. 48

Kii gacangeliyey ayaa calaamo kula ballamay oo ku yidhi,
Mid alla midkaan dhunkado waa isagii ee qabta. **49** Kolkiiba
Ciise buu u yimid oo ku yidhi, Nabad, Macallimow; wuuna
dhunkaday. **50** Kolkaasaa Ciise ku yidhi, Saaxiibow, maxaad
u timid? Markaasay yimaadeen, oo gacmahooda ayay Ciise
saareen oo qabteen. **51** Oo bal eeg, mid ka mid ah kuwii
Ciise la jiray ayaa gacanta fidiyey, oo seeftiisa soo bixiyey,
oo wuxuu ku dhuftay wadaadka sare addoonkiisii, oo dheg
buu ka gooyay. **52** Markaasaa Ciise ku yidhi, Seeftaada
meesheedii ku celi, waayo, kuwa seefo qaada oo dhammu
seef bay ku halligmi doonaan. **53** Ma waxaad u malaynaysaa
inaanan Aabbahay baryi karin oo uusan haddeer ii soo
diri karin malaa'igo laba iyo toban guuto ka badan? **54**
Haddaba sidee buu u noqon doonaa Qorniinku kan leh, Waa
in sidaasu noqotaa? **55** Saacaddaas qudheeda ayaa Ciise
dadkii badnaa ku yidhi, Ma waxaad iila soo baxdeen seefo
iyo ulo inaad i qabataan sidaan tuug ahay? Maalin walbaba
macbudka ayaan fadhiyi jiray oo wax bari jiray, imana
aydnaan qabsan. **56** Laakiin waxan oo dhan ayaa noqday in
qorniinka nebiyadu rumoobo. Markaasaa xertii oo dhammu
ka wada tageen oo carareen. **57** Kuwii Ciise qabtay waxay
u geeyeen Kayafas oo ahaa wadaadkii sare, ilaa meeshii
culimmada iyo waayeelladu ku urursanaayeen. **58** Laakiin
Butros baa meel fog ka soo daba socday ilaa barxadda
wadaadkii sare, wuuna galay oo askartii la fadhiistay inuu
ugudambaysta arko. **59** Wadaaddadii sare iyo shirkii oo
dhan ayaa waxay dooneen markhaati been ah oo Ciise ka
gees ah si ay u dilaan. **60** Waase heli waayeen, in kastoo
markhaatiyaal badan oo been ahu yimaadeen. Laakiinse
dabadeed waxaa yimid laba, **61** oo waxay yidhaahdeen, Kanu
wuxuu yidhi, Waan karayaa inan macbudka Ilaah dudumiyo
oo saddex maalmood ku dhiso. **62** Markaasaa wadaadkii
sare istaagay oo ku yidhi, Miyaanad waxba ka jawaabayn?
Kuwanu waxay kugu marag furayaan waa maxay? **63** Laakiin
Ciise waa iska aamusay. Kolkaasaa wadaadkii sare wuxuu
ku yidhi, Ilaaha nool ayaan kugu dhaarinayaa ee noo sheeg
inaad tahay Masiixa oo ah Wiilka Ilaah, iyo in kale. **64**
Ciise ayaa ku yidhi, Waad tidhi. Hase ahaatee waxaan
idinku leeyahay, Hadda dabadeed waxaad arki doontaan
Wiilka Aadanaha oo fadhiya midigta xoogga Ilaah oo ku
imanaya daruuraha cirka. **65** Markaasaa wadaadkii sare
dharkiisii jeexjeexay isagoo leh, Wuu caytamay. Maxaynu
markhaatiyaal weli ugu baahan nahay? Bal eega, haddeer
waad maqasheen caytanka. **66** Maxay idinla tahay? Way u
jawaabeen oo ku yidhaahdeen, Wuxuu istaahilaa dhimasho.
**67** Markaasay wejiga kaga candhuufeen oo garaaceen.
Qaarna waa dharbaaxeen, **68** oo waxay ku yidhaahdeen,
Noo sheeg, Masiixow. Yuu yahay kan kugu dhuftay? **69**
Butros wuxuu fadhiyey barxadda dibadda ah, markaasaa
gabadh u timid oo waxay ku tidhi, Adiguna waxaad la jirtay
Ciisihii reer Galili. **70** Laakiin dhammaantood ayuu ku hor
dafiray oo wuxuu ku yidhi, Anigu garan maayo waxaad
leedahay. **71** Goortuu iridda tegey mid kale ayaa aragtay, oo
waxay kuwii halkaas joogay ku tidhi, Kanu wuxuu la jiray
Ciisihii reer Naasared. **72** Haddana dhaar ayuu ku dafiray oo
yidhi, Anigu garan maayo ninka. **73** Waxoogaa yar dabadeed
kuwii ag taagnaa ayaa u yimid oo Butros ku yidhi, Run
weeye, adiguna midkood baad tahay, waayo, hadalkaaga
ayaa ku muujinaya. **74** Markaasuu bilaabay inuu caytamo
oo ku dhaarto inaanu ninka garanayn. Kolkiiba diiqii baa
ciyey. **75** Markaasaa Butros wuxuu xusuustay hadalkii Ciise
ku hadlay, Diiqu intaanu ciyin saddex goor ayaad i dafiri
doontaa. Markaasuu baxay oo aad u ooyay.

**27** Goortii aroortii la gaadhay wadaaddadii sare iyo
waayeelladii dadka oo dhan ayaa Ciise wax ka gees
ah ka wada hadlay si ay u dilaan. **2** Markaasay xidheen oo
kaxeeyeen, oo waxay u dhiibeen taliyihii Bilaatos ahaa. **3**
Markaas Yuudas, oo ahaa kii gacangeliyey, goortuu arkay in
la xukumay, ayuu isqoomameeyey, oo soddonkii gogo' oo
lacagta ahaa ayuu wadaaddadii sare iyo waayeelladii ku
celiyey, **4** oo wuxuu ku yidhi, Waan dembaabay markaan
gacangeliyey dhiig eed la'. Laakiin waxay ku yidhaahdeen,
Maxaa noogu jira? Yeelkaa. **5** Markaasuu lacagtii macbudka
gudihiisa ku daadshay oo ka tegey, wuuna baxay oo
isdeldelay. **6** Kolkaasaa wadaaddadii sare lacagtii qaadeen oo
waxay yidhaahdeen, Xalaal ma aha in khasnadda quduuska
ah lagu rido, waayo, waa dhiig iibkiis. **7** Markaasay ka wada
hadleen oo waxay ku iibsadeen dhulka dheriyasameeyaha
in shisheeyaha lagu aaso. **8** Sidaa darteed ilaa maanta
dhulkaas waxaa loogu yeedhaa dhulkii dhiigga. **9** Markaas
waxaa noqotay wixii nebi Yeremyaah lagaga hadlay markuu
yidhi, Waxay qaateen soddonkii gogo' oo lacagta ahaa oo
ah iibkii lagu qiimeeyey isaga, kii bini Israa'iil ku qiimeeyeen.
**10** Waxayna ka bixiyeen dhulka dheriyasameeyaha sida
Rabbigu iigu amray. **11** Ciise wuxuu hor istaagay taliyaha, oo
taliyihiina waa weyddiiyey oo ku yidhi, Ma Boqorkii Yuhuudda
baad tahay? Ciisena wuxuu ku yidhi, Waad tidhi. **12** Goortii
wadaaddadii sare iyo waayeelladii ay ashtakeeyeen, waxba
uma uu jawaabin. **13** Markaasaa Bilaatos ku yidhi, Miyaanad
maqlaynin waxa badan oo ay kugu marag furayaan? **14**
Laakiin uguma uu jawaabin xataa eray keliya, sidaa darteed
taliyihii ayaa aad ula yaabay. **15** Taliyihii waxaa caadadiisu
ahayd inuu iidda dadka u sii daayo maxbuuskay doonayaan.

**16** Markaasay waxay lahaayeen maxbuus caan ah oo la
odhan jiray Baraabbas. **17** Haddaba goortay isu urureen,
Bilaatos ayaa ku yidhi, Iyamaad doonaysaan inaan idiin sii
daayo? Baraabbas ama Ciise kan Masiixa la yidhaahdo?
**18** Waayo, wuxuu ogaa inay hinaaso ugu soo dhiibeen. **19**
Kolkuu kursiga xukumaadda ku fadhiistay ayaa naagtiisii
farriin u soo dirtay oo waxay ku tidhi, Ha dhex gelin xaajada
ninkaas xaqa ah, waayo, maanta anigoo ku riyoonaya isaga,
ayaan aad iyo aad u xanuunsaday. **20** Laakiin wadaaddadii
sare iyo waayeelladii waxay dadkii badnaa oggolaysiiyeen
inay Baraabbas weyddiistaan, Ciisena la dilo. **21** Laakiin
taliyihii ayaa u jawaabay oo ku yidhi, Labadooda kee baad
doonaysaan inaan idiin sii daayo? Waxay yidhaahdeen,
Baraabbas. **22** Markaasaa Bilaatos wuxuu ku yidhi, Haddaba
maxaan ku sameeyaa Ciise kan Masiixa la yidhaahdo?
Kulligood waxay wada yidhaahdeen, Iskutallaabta ha lagu
qodbo. **23** Oo wuxuu yidhi, Waayo, waa maxay sharkuu
falay? Laakiin aad bay u sii qayliyeen oo yidhaahdeen,
Iskutallaabta ha lagu qodbo. **24** Bilaatos goortuu arkay
inuusan waxba ka tari karin in rabshad kacdo maahee,
ayuu biyo qaatay oo dadka hortooda ku gacmo dhaqday
oo wuxuu yidhi, Anigu waan ka eedla'ahay ninkan xaqa
ah dhiiggiisa. Idinku yeelkiinna. **25** Dadkii oo dhammu waa
wada jawaabeen oo yidhaahdeen, Dhiiggiisu annaga iyo
carruurtayadaba ha dul saarnaado. **26** Markaasuu Baraabbas
u sii daayay, oo goortuu Ciise karbaashay ayuu u dhiibay in
iskutallaabta lagu qodbo. **27** Markaasaa taliyaha askartiisii
waxay Ciise geeyeen guriga taliyaha, oo waxay isaga ku soo
ururiyeen askartii oo dhan. **28** Dharkiisii ayay ka qaadeen oo
waxay u geliyeen dhar guduudan. **29** Markaasay taaj qodxan
uga taxeen oo madaxiisay saareen, cawsduurna gacantiisa
midigtaa ayay u geliyeen, oo intay hortiisa jilba joogsadeen
oo ku majaajiloodeen ayay waxay ku yidhaahdeen, Nabad,
Boqorka Yuhuuddow. **30** Wayna ku candhuufeen, markaasay
cawsduurkii ka qaadeen oo madaxay kaga dhufteen. **31**
Oo goortay ku majaajiloodeen dabadeed ayay dharkii ka
qaadeen oo dharkiisii bay u geliyeen, markaasay wadeen in
iskutallaabta lagu qodbo. **32** Goortay soo baxeen, waxay
arkeen nin reer Kuranaya ah oo Simoon la odhan jiray,
kan ay ku qasbeen inuu iskutallaabtiisa u qaado. **33** Oo
goortay yimaadeen meel Golgota la odhan jiray, tan la
yidhaahdo meeshii dhakada, **34** waxay siiyeen inuu cabbo
khamri xammeeti lagu daray, goortuu dhadhamiyeyse wuu
diiday inuu cabbo. **35** Oo goortay iskutallaabta ku qodbeen,
dharkiisay qaybsadeen, wayna saami riteen si wixii nebigu ku
hadlay u noqdaan, Dharkaygii bay qaybsadeen oo maradaydii
bay saami u riteen. **36** Meeshaasna ayay fadhiisteen oo
dhawreen. **37** Waxay meel madaxiisa ka korraysa ku qoreen
ashtakadii lagu ashtakeeyey oo leh, KANU WAA CIISE
BOQORKA YUHUUDDA. **38** Markaasaa waxaa iskutallaabo
lagu la qodbay laba tuug, mid midigta, midna bidixda. **39**
Kuwii ag marayayna waa caayeen, oo intay madaxooda
luleen, **40** waxay yidhaahdeen, Kaaga macbudka duminayow
oo saddex maalmood ku dhisayow, isbadbaadi, haddii aad
tahay Wiilka Ilaah, oo iskutallaabta ka soo deg. **41** Sidaas
oo kale ayaa wadaaddada sare ugu majaajiloodeen, iyaga
iyo culimmada iyo waayeelladaba, oo waxay yidhaahdeen,
**42** Kuwa kale ayuu badbaadiyey, qudhiisa isma badbaadin
karo. Waa Boqorka Israa'iil; haddeer iskutallaabta ha ka
soo dego, annaguna waannu rumaysan doonnaaye. **43**
Ilaah buu isku halleeyey, haddeer ha bixiyo hadduu isaga ku
faraxsan yahay, waayo, wuxuu yidhi, Waxaan ahay Wiilka
Ilaah. **44** Tuugaggii iskutallaabaha lagu la qodbayna sidaas
oo kale ayay u caayeen. **45** Hadda saacaddii lixaad ilaa
saacaddii sagaalaad dhulka oo dhammu gudcur buu ahaa.
**46** Abbaaraha saacaddii sagaalaad Ciise ayaa cod weyn ku
dhawaaqay oo yidhi, Eloy, Eloy, lama sabakhtani, waxaa
weeye, Ilaahayow, Ilaahayow, maxaad ii dayrisay? **47** Kuwa
halkaas taagnaa qaarkood ayaa goortay maqleen, yidhi,
Kanu wuxuu u yeedhayaa Eliyaas. **48** Kolkiiba midkood
baa orday oo qaaday geed isbonji la yidhaahdo, oo khal
uga soo buuxshay, oo intuu cawsduur saaray ayuu siiyey
inuu cabbo. **49** Kuwa kale ayaa yidhi, Daaya aynu aragnee
inuu Eliyaas yimaado oo badbaadiyo. **50** Markaasaa Ciise
goortuu mar kale cod weyn ku dhawaaqay, ruuxii bixiyey.
**51** Oo bal eeg, daahi macbudka ayaa kor ilaa hoos laba
u kala dillaacay, dhulkiina waa gariiray, dhagaxyadiina
waa kala dildillaaceen. **52** Xabaalihiina waa furmeen, oo
quduusiin badan oo hurdayna meydadkoodii waa la kiciyey.
**53** Sarakiciddiisa dabadeed ayay xabaalaha ka soo baxeen,
oo waxay galeen magaalada quduuska ah, oo waxay u
muuqdeen dad badan. **54** Boqol-u-taliyihii iyo kuwii la jiray
oo Ciise dhawrayay, goortay arkeen dhulgariirkii iyo wixii
dhacay, aad bay u baqeen oo yidhaahdeen, Runtii, kanu
wuxuu ahaa Wiilkii Ilaah. **55** Waxaana halkaas joogay dumar
badan oo meel fog ka eegayay, kuwii Ciise ka soo raacay
Galili oo u adeegi jiray isaga, **56** oo waxaa ku dhex jirtay
Maryantii reer Magdala, iyo Maryan oo ahayd Yacquub iyo
Yoosee hooyadood, iyo wiilashii Sebedi hooyadood. **57**
Goortay casarkii ahayd waxaa yimid nin reer Arimataya
oo hodan ah oo Yuusuf la odhan jiray, oo isaguna Ciise
xertiisa ahaa. **58** Kaasu wuxuu u tegey Bilaatos oo ka baryay
Ciise meydkiisii. Markaasaa Bilaatos amray in loo dhiibo.
**59** Yuusuf goortuu meydkii qaaday ayuu kafan nadiif ah ku

duudduubay, 60 oo wuxuu geliyey xabaashiisii cusbayd, tan
uu dhagax ka qoday, oo xabaashii afkeedii wuxuu ku soo
giringiriyey dhagax weyn, wuuna ka tegey. 61 Oo halkaas
waxaa joogay Maryantii reer Magdala iyo Maryantii kale,
oo waxay fadhiyeen meel xabaashii ka soo hor jeedda.
62 Maalintii dambe oo ku xigtay Maalintii Diyaargarayska,
wadaaddadii sare iyo Farrisiintii waxay u wada yimaadeen
Bilaatos, 63 oo waxay ku yidhaahdeen, Sayidow, waxaannu
xusuusan nahay in khaa'inkaasu yidhi, intuu weli noolaa,
Saddex maalmood dabadeed waan soo sara kacayaa. 64
Haddaba amar in xabaashii aad loo dhawro ilaa maalinta
saddexaad inaan xertiisu iman oo xadin oo aanay dadka
ku odhan, Kuwii dhintay wuu ka soo sara kacay, oo aanay
khiyaanada dambe ka sii xumaan tii hore. 65 Bilaatos wuxuu
ku yidhi, Waardiyayaal baad leedihiin. Taga oo adkeeya in
alla intaad adkayn taqaaniin. 66 Markaasay tageen, iyaga iyo
waardiyayaashii, oo xabaashay soo adkeeyeen, dhagixiina
way shaabadeeyeen.

28 Sabtidii dabadeed goortii waagii beryayay maalintii ugu
horraysay ee toddobaadka, Maryantii reer Magdala iyo
Maryantii kale waxay u yimaadeen inay xabaashii arkaan. 2
Oo bal eeg, waxaa jiray dhulgariir weyn, waayo, malaa'igta
Rabbiga ayaa intay samada ka soo degtay timid oo dhagixii
ka giringirisay oo ku dul fadhiisatay. 3 Midabkeedu wuxuu u
ekaa hillaac, dharkeeduna wuxuu u caddaa sida baraf cad.
4 Oo cabsi aawadeed kuwii ilaalinayay waa gariireen, oo
waxay noqdeen sida meydad. 5 Malaa'igtii ayaa u jawaabtay
oo naagihii ku tidhi, Ha baqina, waayo, waxaan ogahay
inaad doonaysaan Ciise, kan iskutallaabta lagu qodbay. 6
Halkan ma joogo, waayo, wuu sara kacay siduu yidhi. Bal
kaalaya oo arka meeshii Rabbigu jiifay. 7 Dhaqso u taga, oo
waxaad xertiisii ku tidhaahdaan, Kuwii dhintay ayuu ka soo
sara kacay, oo wuu idin hor marayaa ilaa Galili. Halkaasna
waad ku arki doontaan. Bal eega, waan idiin sheegaye. 8
Dhaqsoba waxay xabaashii kala tageen baqdin iyo farxad
weyn, oo waxay u ordeen inay xertiisa u warramaan. 9
Kolkaasaa Ciise ka hor yimid oo ku yidhi, Nabad. Markaasay
u dhowaadeen oo intay cagihiisa qabteen ayay caabudeen.
10 Markaasaa Ciise wuxuu ku yidhi, Ha baqina. Taga oo
walaalahay u sheega inay Galili tagaan, oo halkaasay igu
arki doonaan. 11 Intay sii socdeen ayaa waardiyayaashii
qaarkood magaaladii yimid, oo waxay wadaaddadii sare
uga warrameen wixii dhacay oo dhan. 12 Iyaguna goortay
waayeelladii la shireen oo ay wada hadleen, ayay askartii
lacag badan siiyeen, 13 oo waxay ku yidhaahdeen, Waxaad
tidhaahdaan, Xertiisii ayaa habeennimo timid oo xadday
isaga intii aannu hurudnay. 14 Oo haddii taliyihii waxan
maqlo, waannu rumaysiinaynaa oo waannu idiin welwel
tiraynaa. 15 Markaasay lacagtii qaateen oo yeeleen sidii
lagu yidhi. Hadalkanu maalintaas ilaa maanta waa ku dhex
firdhisanaa Yuhuudda. 16 Markaasaa koob-iyo-tobankii xerta
ahaa Galili tageen ilaa buurtii Ciise kula ballamay. 17 Oo
goortay arkeen isagii, way caabudeen, laakiin qaar baa
shakiyey. 18 Oo Ciise ayaa u yimid oo la hadlay, oo wuxuu
ku yidhi, Amar oo dhan ayaa samada iyo dhulka laygu siiyey.
19 Haddaba taga, oo quruumaha oo dhan xer ka dhiga, oo ku
baabtiisa magaca Aabbaha iyo Wiilka iyo Ruuxa Quduuskaa,
20 oo bara inay dhawraan wax walba oo aan idinku amray,
oo bal eega had iyo goor ayaan idinla joogaa xataa ilaa
wakhtigu dhammaado. **(aiōn g165)**

# Markos

1 Bilowgii injiilkii Ciise Masiix, oo ah Wiilka Ilaah. 2 Sidii
Nebi Isayos u qoray, Eeg, waxaan hortaada soo dirayaa
wargeeyahayga, Kan jidkaaga diyaargarayn doona; 3 Waa
codka kan cidlada kaga qaylinaya, Jidka Rabbiga hagaajiya,
Waddooyinkiisa toosiya. 4 Waxaa yimid Yooxanaa kan
cidlada dadka ku baabtiisayay oo ku wacdiyeyey baabtiiskii
toobadda dembidhaafka aawadiis. 5 Markaasaa waxaa u soo
baxay dadkii Yahuudiya oo dhan iyo kuwii Yeruusaalem oo
dhan, oo kulligoodna Webi Urdun ayuu ku baabtiisay, iyagoo
dembiyadooda qiranaya. 6 Yooxanaa wuxuu guntanaa
dharkiisii dhogorta geel ahaa, oo suun meged ahna dhexduu
ku xidhnaa, oo wuxuu cunay ayax iyo malab dibadeed. 7
Oo wax buu wacdiyey oo yidhi, Waxaa iga daba imanaya
ku iga itaal weyn, kan aanan istaahilin inaan foororsado
oo aan yeelmihii kabihiisa furo. 8 Anigu waxaan idinku
baabtiisay biyo, isaguse wuxuu idinku baabtiisi doonaa
Ruuxa Quduuska ah. 9 Wakhtigaas waxay noqotay in Ciise
ka yimid Naasared tii Galili, oo Yooxanaa baa Webi Urdun
ku baabtiisay isagii. 10 Markiiba intuu biyihii ka soo baxay
wuxuu arkay samooyinkii oo kala dillaacay iyo Ruuxii oo
sidii qoolley oo kale dushiisa ugu soo degaya. 11 Waxaa
samooyinka ka yimid cod leh, Adigu waxaad tahay Wiilkayga
aan jeclahay oo aan ku faraxsanahay. 12 Oo markiiba
Ruuxii baa xaggii cidlada u eryay. 13 Afartan maalmood
buu cidlada joogay, Shayddaan baana jirrabay oo wuxuu la
jiray dugaagga, malaa'igahuna waa u adeegeen. 14 Kolkii
Yooxanaa la qabtay dabadeed, Ciise wuxuu yimid Galili,
oo wuxuu dadka ku wacdiyey injiilka Ilaah, 15 wuxuuna
yidhi, Wakhtigii waa buuxsamay, oo boqortooyadii Ilaah
waa soo dhowaatay; toobadkeena oo injiilka rumaysta. 16
Markuu badda Galili ag marayay, wuxuu arkay Simoon
iyo walaalkiis Andaros, iyagoo shabag badda ku tuuraya,
waayo, waxay ahaayeen kuwa kalluun jillaabta. 17 Ciise
wuxuu ku yidhi, I soo raaca. Waxaan idinka dhigayaa
kuwa dadka jillaabta. 18 Markiiba shabagyadoodii way ka
tageen, wayna raaceen. 19 Markuu cabbaar socday, wuxuu
arkay Yacquub ina Sebedi iyo walaalkiis Yooxanaa, iyagoo
doonnida dhexdeeda shabagyadoodii ku hagaajinaya. 20
Markiiba wuu u yeedhay. Kolkaasay aabbahood Sebedi
iyo shaqaalayaasha kaga soo tageen doonnida, oo isagay
raaceen. 21 Markaasay Kafarna'um galeen, oo markiiba
sabtida wuxuu galay sunagogga oo dadka wax baray. 22
Waxayna la yaabeen wax bariddiisa, waayo, wuxuu wax
u barayay sida mid amar leh, oo uma uu baraynin sida
culimmada. 23 Markaasaa waxaa sunagoggoodii ku jiray nin
jinni wasakh leh qaba, wuuna qayliyey, oo wuxuu yidhi, 24
Maxaa inoo dhexaya, Ciise reer Naasaredow? Ma waxaad u
timid inaad na baabbi'iso? Anigu waa ku garanayaa kii aad
tahay Kan Quduuska ah ee Ilaah. 25 Ciise baa canaantay oo
ku yidhi, Aamus oo ka soo bax. 26 Goortii jinnigii wasakhda
lahaa gilgilay oo cod weyn ku qayliyey, ayuu ka soo baxay.
27 Kulligoodba ayay la wada yaabeen, sidaa aawadeed
iyaga dhexdooda way isweyddiiyeen oo yidhaahdeen, Waa
maxay waxani? Ma wax barid cusub baa? Xataa jinniyadii
wasakhda lahayd amar buu ku amraa, wayna yeelaan. 28
Markiiba warkiisii waa gaadhay dhulkii Galili ku wareegsanaa
oo dhan. 29 Oo markiiba kolkay sunagoggii ka soo baxeen,
waxay galeen guriga Simoon iyo Andaros, iyaga iyo Yacquub
iyo Yooxanaaba. 30 Simoon soddohdiis baa qandho la jiiftay,
oo kolkiiba waxay isaga u sheegeen wax iyada ku saabsan.
31 Markaasuu u soo dhowaaday oo gacanteeda qabtay
oo uu kiciyey. Kolkiiba qandhadii waa ka baxday oo ay u
adeegtay iyaga. 32 Makhribkii goortay qorraxdii dhacday,
waxay u keeneen kuwa buka oo dhan iyo kuwa jinniyo qaba.
33 Markaasaa dadkii magaalada oo dhan albaabka ku soo
ururay. 34 Oo wuxuu bogsiiyey dad badan oo cudurro kala
cayncayn ah qabay, dadkana jinniyo badan buu ka saaray,
oo uma oggolaanin jinniyadu inay hadlaan, waayo, isagay
garanayeen. 35 Aroortii hore intaan weli waagii beryin ayuu
kacay oo wuxuu tegey meel cidla ah, halkaasuuna ku soo
tukanayay. 36 Markaasaa Simoon iyo kuwii la jiray ka daba
tageen. 37 Goortay heleen waxay ku yidhaahdeen, Dadka
oo dhan baa ku doondoonaya. 38 Wuxuu ku yidhi, Aan tagno
magaalooyinka inoo dhow, inaan halkaasna wax ku wacdiyo;
waayo, taas aawadeed ayaan u imid. 39 Wuxuu galay
sunagogyadoodii Galili ku yiil oo dhan; dadkana ayuu ka
wacdiyey, jinniyadiina ayuu dadka ka saaray. 40 Markaasaa
waxaa u yimid nin baras leh, wuuna jilba joogsaday oo
baryay, oo ku yidhi, Haddaad doonaysid waad i daahirin
kartaa. 41 Kolkaasaa Ciise u naxariistay, oo intuu gacantiisa
soo taagay, ayuu taabtay oo ku yidhi, Waa doonayaa ee
daahirsanow. 42 Kolkiiba baraskii waa ka baxay, oo wuu
daahirsanaaday. 43 Ciisena aad buu u xukumay, oo markiiba
ayuu iska diray, 44 oo ku yidhi, Ninna waxba ha kala hadlin,
laakiin tag oo wadaadka istus. Waxaad daahirsanaantaada
u bixisaa wixii uu Muuse amray, marag iyaga ha u ahaatee.
45 Laakiin wuu baxay oo bilaabay inuu aad u naadiyo oo
warka faafiyo, taas aawadeed kol dambe Ciise magaaladuu
bayaan u geli kari waayay, laakiin wuxuu joogay dibadda ee
meelo cidla ah, meel kastana waa looga yimid.

**2** Dhawr maalmood dabadeed goortuu haddana Kafarna'um
galay, waxaa la maqlay inuu guriga joogo. 2 Markaasaa
waxaa is-urursaday dad badan, sidaa daraaddeed meel ay
joogsadaan ayay ka waayeen xataa albaabka hortiisii, oo
iyaga ayuu ereygii kula hadlay. 3 Kolkaasay u yimaadeen oo
nin curyaan ah u keeneen, waxaana siday afar qof. 4 Goortay
u soo dhowaan kari waayeen dadkii badnaa daraaddiis
ayay saqafka dusha ka fureen meeshuu joogay. Goortii ay
jebsheen, waxay ka soo dejiyeen sariirtii ninkii curyaanka
ahaa ku jiifay. 5 Ciise kolkuu rumaysadkoodii arkay, ayuu
ninkii curyaanka ahaa ku yidhi, Wiilkow, dembiyadaadu waa
cafiyan yihiin. 6 Laakiin halkaa waxaa joogay qaar culimmada
ah oo iska fadhiyey oo qalbiyadooda ka fikirayay, oo waxay
isku yidhaahdeen, 7 Ninkanu muxuu sidan ugu hadlayaa?
Wuu caytamayaa. Ayaa dembiyo cafiyi kara Ilaah keliya
maahee? 8 Kolkiiba Ciise ruuxiisuu ka ogaaday inay sidaas
qalbiyadooda ka fikirayaan, oo wuxuu ku yidhi, Maxaad
waxan qalbiyadiinna ugaga fikiraysaan? 9 Iyamaa hawl yar,
in curyaanka lagu yidhaahdo, Dembiyadaadu waa cafiyan
yihiin, ama in lagu yidhaahdo, Kac oo sariirtaada qaado oo
soco? 10 Laakiin si aad ku garataan in Wiilka Aadanahu
dhulka ku leeyahay amar uu dembiyada ku cafiyo (ayuu
ninkii curyaanka ahaa ku yidhi), 11 Waxaan ku leeyahay,
Kac oo sariirtaada qaado oo gurigaaga tag. 12 Kolkiiba wuu
kacay oo sariirtiisii qaatay; wuuna baxay dadkii oo dhan
hortooda, sidaa darteed ayay la wada yaabeen, wayna
ammaaneen Ilaah, oo waxay yidhaahdeen, Weligayo sidan
oo kale ma aannu arag. 13 Haddana wuu u baxay badda
xeebteeda, oo dadkii oo dhan baa u yimid, wuuna wax baray.
14 Goortuu ag marayay, wuxuu arkay Laawi ina Alfayos,
isagoo fadhiya meesha cashuurta lagu qaado, oo uu ku yidhi
isaga, I soo raac. Wuuna kacay oo raacay. 15 Waxaa dhacay
markii Ciise gurigiisa cunto u fadhiistay in kuwa badan oo
cashuurqaadayaal iyo dembilayaal ah Ciise iyo xertiisii la
fadhiistay; waayo, way badnaayeen, wayna raaceen. 16
Culimmadii iyo Farrisiintii markay arkeen isagoo dembilayaal
iyo cashuurqaadayaal wax la cunaya, waxay xertiisii ku
yidhaahdeen, Waa sidee? Wuxuu wax la cunaa oo la cabbaa
cashuurqaadayaal iyo dembilayaal. 17 Ciise goortuu maqlay
ayuu ku yidhi, Kuwa ladan dhakhtar uma baahna, laakiin
kuwa buka ayaa u baahan. Uma aan imanin inaan kuwa
xaqa ah u yeedho, laakiin inaan dembilayaasha u yeedho
ayaan u imid. 18 Xertii Yooxanaa iyo Farrisiintii ayaa soomi
jiray. Isagay u yimaadeen oo waxay ku yidhaahdeen, Xertii
Yooxanaa iyo xertii Farrisiintu maxay u soomaan oo ay
xertaadu u soomi weydaa? 19 Markaasaa Ciise ku yidhi,
Dadka aroosku miyay soomi karaan intuu aroosku la joogo?
In alla intii aroosku la joogo ma ay soomi karaan. 20 Laakiin
waxaa iman doona maalmaha arooska laga qaadi doono,
markaasay soomi doonaan maalintaas. 21 Ninna karriin
cusub kuma tolo dhar duug ah, haddii kale tan cusub ee lagu
buuxin lahaa ayaa ka go'da kan duug ah, oo jeexdintu waa ka
sii xumaataa. 22 Khamri cusubna qarbeddo duug ah laguma
shubo, haddii kale khamrigii cusbaa ayaa qarbeddada kala
dildillaacinaya, khamriguna waa daadanayaa, qarbeddaduna
waa hallaabayaan, laakiin khamriga cusubse waxaa lagu
shubaa qarbeddo cuscusub. 23 Waxaa dhacay inuu sabtidii
beeraha dhex marayay, oo xertiisii intay soconayeen ayay
bilaabeen inay sabuullada jartaan. 24 Markaasaa Farrisiintii
waxay isaga ku yidhaahdeen, Bal eeg, maxay sabtida
u samaynayaan wixii aan xalaal ahayn? 25 Wuxuu ku
yidhi, Miyaydnaan weligiin akhriyin wixii Daa'uud sameeyey
markuu wax u baahnaa oo uu gaajaysnaa, isaga iyo kuwii la
jiray? 26 Siduu guriga Ilaah u galay waagii wadaadkii sare ee
Aabyaataar, oo uu u cunay kibistii tusniinta oo aan xalaal uu
ahayn dad kale wadaaddada maahee, oo uu siiyey kuwii la
jirayna. 27 Markaasaa wuxuu ku yidhi iyaga, Sabtida waxaa
loo sameeyey dadka aawadiis ee dadka looma samayn
sabtida aawadeed. 28 Sidaa darteed Wiilka Aadanahu waa
sayidka sabtida.

**3** Kol dambe wuxuu galay sunagogga; halkaasna waxaa
joogay nin gacan engegan. 2 Markaasay fiirinayeen inuu
sabtida bogsiinayo iyo in kale, si ay u ashtakeeyaan. 3
Kolkaasuu ninkii gacanta engegnaa ku yidhi, Dhexda isa soo
taag. 4 Oo wuxuu iyaga ku yidhi, Sabtida ma xalaal baa in
wanaag la falo ama shar; in naf la badbaadiyo ama la dilo?
Laakiin way iska aamuseen. 5 Goortuu iyaga isha mariyey
isagoo cadhaysan oo qalbigiisii ka tiiraanyooday qalbi
engegnaantooda aawadeed, wuxuu ninkii ku yidhi, Gacanta
soo taag. Kolkaasuu soo taagay, oo gacantiisu way bogsatay.
6 Markaasaa Farrisiintu baxeen, oo markiiba waxay kala
tashadeen Herodosiintii si ay u dilaan isaga. 7 Laakiin Ciise
xertiisii ayuu badda kula noqday; waxaana raacay dad badan
oo ka yimid Galili, iyo Yahuudiya, 8 iyo Yeruusaalem, iyo
Idumiya, iyo Webi Urdun shishadiisa, iyo kuwa ag joogay
Turos iyo Siidoon; dad tiro badan goortii ay maqleen waxa
weyn ee uu samaynayay ayay u yimaadeen. 9 Xertiisii wuu
la hadlay oo wuxuu ku yidhi, Doonni yar ha i sugto dadkii
badnaa aawadiis si ayan ii cidhiidhiyin. 10 Waayo, dad
badan ayuu bogsiiyey, sidaa daraaddeed ayay waxay ugu
kufeen si ay kuwii cudur qabay oo dhan u taabtaan isaga. 11
Oo jinniyada wasakhda lehna goortay arkeen, hortiisii ayay
isku tuureen oo qayliyeen, oo waxay yidhaahdeen, Adigu
waxaad tahay Wiilka Ilaah. 12 Aad buu u amray inaanay

dadka ogeysiinin isaga. 13 Goortaasuu buurta fuulay; wuu u
yeedhayna kuwii uu doonayay; wayna u yimaadeen. 14 Laba
iyo toban ayuu soo saaray inay isaga la joogaan, iyo inuu u
diro inay wax wacdiyaan, 15 iyo inay u leeyihiin amar ay
cudurro ku bogsiiyaan oo ay jinniyo ku saaraan. 16 Waxay
ahaayeen Simoon, kan uu Butros u bixiyey, 17 iyo Yacquub
ina Sebedi, iyo Yooxanaa, Yacquub walaalkiis, iyaga wuxuu
u bixiyey Bo'anerges, waxaa weeye wiilashii onkodka, 18
iyo Andaros, iyo Filibos, iyo Bartolomayos, iyo Matayos, iyo
Toomas, iyo Yacquub ina Alfayos, iyo Tadayos, iyo Simoon
reer Kaana, 19 iyo Yuudas Iskariyod, kii gacangeliyey. 20
Kolkaasuu guri galay; oo dad badan ayaa haddana ku
soo ururay si aanay karin inay kibis cunaan. 21 Xigtadiisii
goortay maqleen, ayay u soo baxeen inay qabtaan, waayo,
waxay yidhaahdeen, Isagu waa waalan yahay. 22 Culimmadii
Yeruusaalem ka soo degeenna waxay yidhaahdeen, Wuxuu
qabaa Be'elsebul, oo madaxda jinniyada ayuu jinniyada ku
saaraa. 23 Kolkaasuu iyagii u yeedhay oo masaallo kugu
yidhi, Sidee baa Shayddaan Shayddaan u saari karaa? 24
Haddii boqortooyo kala qaybsanto, boqortooyadaasu ma
taagnaan karto. 25 Haddii gurina kala qaybsamo, gurigaasu
ma taagnaan kari doono. 26 Haddii Shayddaanna isku kaco
oo qaybsamo, ma taagnaan karo. Laakiin wuxuu leeyahay
dhammaansho. 27 Ninna nin xoog leh gurigiisa ma geli karo
inuu alaabtiisa dhaco hadduusan kolkii hore ninka xoogga
leh xidhin, goortaasuu gurigiisa dhici doonaa. 28 Runtii
waxaan idinku leeyahay, Bini-aadmiga waa loo cafiyi doonaa
dembiyadii oo dhan iyo caydii ay ku caytamaan; 29 laakiin ku
alla kii caaya Ruuxa Quduuska ah, weligiis cafiga heli maayo,
laakiin wuxuu eed u leeyahay dembi weligiis ah; **(aiōn g165,
aiōnios g166)** 30 waayo, waxay yidhaahdeen, Jinni wasakh
leh ayuu qabaa. 31 Markaasaa waxaa yimid walaalihiis iyo
hooyadiis, oo dibadday istaageen, waxayna u direen cid ugu
yeedha. 32 Dad badan baa agtiisa fadhiyey oo waxay ku
yidhaahdeen, Bal eeg, hooyadaa iyo walaalahaa dibadday
joogaan oo waa ku doonayaan. 33 Markaasuu u jawaabay
oo ku yidhi, Yaa ah hooyaday iyo walaalahay? 34 Kolkaasuu
isha mariyey kuwii agtiisa fadhiyey oo ku yidhi, Waa kuwan
hooyaday iyo walaalahay! 35 Ku alla kii yeela doonistii Ilaah
kaasaa walaalkay iyo walaashay iyo hooyaday.

**4** Haddana wuxuu bilaabay inuu badda agteeda wax ku
baro, oo waxaa u soo ururay dad badan, sidaa darteed
doonni ayuu fuulay, wuxuuna fadhiistay badda, dadkii
badnaana waxay joogeen badda xeebteeda. 2 Markaasuu
wax badan masaallo ku baray, oo intuu wax barayay ayuu
iyaga ku yidhi, 3 Dhegaysta, waxaa baxay beerrey inuu
wax beero. 4 Intuu beerayay qaar baa jidka geestiisa ku
dhacay, kolkaasaa shimbirro yimaadeen oo cuneen. 5 Qaar
kalena waxay ku dhaceen dhul dhagax ah oo aan carro
badan lahayn; kolkiiba way soo baxeen, waayo, carradu
hoos uma dheerayn, 6 laakiin qorraxdu goortay soo baxday
way gubteen, waana engegeen, waayo, xidid ma lahayn. 7
Qaar kalena waxay ku dhex dhaceen qodxan, qodxantiina
waa soo baxday oo ceejisay, oo midho ma ay dhalin. 8
Qaar kalena dhul wanaagsan bay ku dhaceen, oo intay
baxeen ayay koreen oo midho dhaleen. Mid wuxuu dhalay
soddon, midna lixdan, midna boqol. 9 Oo wuxuu ku yidhi,
Kan dhego wax lagu maqlo lahu ha maqlo. 10 Goortuu
keligiis ahaa kuwii la joogay iyo laba-iyo-tobankii wax bay
masaalladii ka weyddiiyeen. 11 Kolkaasuu ku yidhi, Idinka
waa laydin siiyaa inaad waxa qarsoon ee boqortooyada Ilaah
garataan, laakiin kuwa dibadda jooga wax walba waxaa
loogu sheegaa masaallo, 12 si ay goortay arkayaan ayan u
arkin, oo si ay goortay maqlayaan ayan u garan, si ayan u
soo noqon oo aan loo cafiyin. 13 Wuxuuna iyaga ku yidhi,
Miyaydnaan masaalkan garanaynin? Sidee baad masaalladii
oo dhan u garan doontaan? 14 Beerreygu wuxuu beeraa
hadalka. 15 Waa kuwan kuwii jidka yiil meeshii hadalka
lagu beeray, oo goortay maqlaan, Shayddaan baa kolkiiba
yimaada oo ka qaada hadalkii lagu beeray iyaga. 16 Si la
mid ahna kuwan waa kuwii dhul dhagax ah lagu beeray,
kuwii goortay hadalkii maqlaanba kolkiiba farxad bay ku
qaataan; 17 xididse isagu ma leh, laakiin wakhti yar bay sii
jiraan, markii dambe goortii dhib ama silac u dhoco hadalka
aawadiis, markiiba way ka xumaadaan. 18 Kuwanna waa
kuwii qodxanta lagu dhex beeray, kuwa hadalka maqla, 19
laakiin kawelwelidda dunidan, iyo sasabidda maalka, iyo
damacyada wax kale ayaa gala oo hadalkii ceejiya, oo
wuxuu noqdaa midhola'aan. **(aiōn g165)** 20 Kuwanna waa
kuwii dhulka wanaagsan lagu beeray, kuwa hadalka maqla,
oo aqbala, oo midho soo dhala, mid soddon, midna lixdan,
midna boqol. 21 Wuxuuna iyaga ku yidhi, Ilays ma waxaa
loo keenaa in la hoos geliyo weel ama sariir? Sow lama
saaro meeshii ilayska? 22 Wax qarsoon ma jiro oo aan soo
muuqan doonin, oo wax daboolanna ma jiro oo aan bannaan
soo bixi doonin. 23 Haddii nin leeyahay dhego uu wax ku
maqlo ha maqlo. 24 Kolkaasuu ku yidhi, U fiirsada waxaad
maqlaysaan; qiyaastii aad ku qiyaastaan ayaa laydiinku
qiyaasi doona oo ayaa laydiin kordhin doonaa. 25 Kii wax
haysta waa la siin doonaa. Kii aan waxba haysanse waa laga
qaadi doonaa wuxuu haysto. 26 Wuxuuna yidhi, Sidaa weeye
boqortooyadii Ilaah, sida nin abuur dhulka ku daadsha. 27
Isagu waa hurdaa, waana kacaa maalin iyo habeenba, oo

abuurku waa baxaa oo weynaadaa, laakiin si ay tahay isagu
garan maayo. 28 Dhulka keligiis ayaa midhaha bixiya, horta
jirridda, dabadeed sabuulka, dabadeedna sabuulka midho
ka buuxsama. 29 Laakiin goortii midhuhu soo bislaadaan,
kolkiiba ayuu mindi la galaa, waayo, wakhtigii beergooyska
ayaa yimid. 30 Wuxuuna yidhi, Maxaynu boqortooyadii Ilaah
la masaysiinnaa, oo masaalkee baynu u ekaysiinnaa? 31
Wuxuu yahay sida iniin khardal oo kale, tan goortii dhulka
lagu beero waa ka wada yar tahay iniinaha dhulka ku
jira oo dhan. 32 Laakiin goortii la beero way baxdaa oo
ka weynaataa dhalatada oo dhan, oo ay laamo waaweyn
bixisaa si ay shimbirraha cirku hooskeeda ugu degaan. 33
Masaallo badan oo tan oo kale ah ayuu ereyga kula hadlay
intii ay maqli karayeen. 34 Laakiin masaalla'aan kulama
uu hadlin, oo markay keligood ahaayeen ayuu wax walba
xertiisii u fasiray. 35 Maalintii qudheedii, goortii makhribkii
la gaadhay, wuxuu iyaga ku yidhi, Dhanka kale aan u
gudubnee. 36 Goortay dadkii badnaa direen, isagay wadeen
intuu doonnidii ku jiray, oo doonniyo yaryar oo kalena way la
jireen. 37 Waxaa kacay duufaan weyn oo dabayl ah, hirarkiina
doonniday ku dhaceen ilaa ay doonnidii buuxsamaysay. 38
Isaguna wuxuu joogay xaggii dambe ee doonnida isagoo
barkin ku hurda. Markaasay toosiyeen oo ku yidhaahdeen,
Macallimow, miyaanay waxba kula ahayn inaynu lunno?
39 Kolkaasuu kacay oo dabayshii canaantay, oo badduu
ku yidhi, Aamus oo xasil. Markaasaa dabayshii degtay oo
xawaal weyn baa dhacday. 40 Goortaasuu wuxuu iyaga ku
yidhi, Maxaad sidaa ugu baqaysaan? Sidee baydnaan weli
rumaysad u lahayn? 41 Aad bay u baqeen, oo waxay isku
yidhaahdeen, Haddaba yuu yahay kan xataa dabaysha iyo
badduba yeelaan?

**5** Waxay yimaadeen dhanka kale oo badda ilaa dalkii
Gadareni. 2 Goortuu doonnidii ka degay, kolkiiba waxaa la
kulmay nin xabaalaha ka soo baxay oo jinni wasakh leh qaba.
3 Isagu xabaalaha ayuu dhex fadhiyi jiray, oo ninna xataa
silsilad kuma xidhi kari jirin. 4 Maxaa yeelay, marar badan bir
cagaha iyo silsilado waa lagu xidhi jiray, silsiladihiina ayuu
iska gooyn jiray, bir cagahana wuu kala jejebin jiray. Ninna
ka adkaan kari waayay. 5 Weligiiba, habeen iyo maalin,
ayuu buuraha iyo xabaalaha joogi jiray isagoo qaylinaya oo
dhagaxyona isku jarjaraya. 6 Laakiin goortuu Ciise meel fog
ka arkay, ayuu ku soo orday oo u sujuuday. 7 Markaasuu
cod weyn ku qayliyey oo ku yidhi, Maxaa inoo dhexeeya,
Ciisow adigoo ah Wiilka Ilaaha sarow? Ilaah baan kugu
dhaarinayaa, Ha i silcin. 8 Waayo, wuxuu ku yidhi, Ka soo
bax ninka, jinni wasakh lahow. 9 Markaasuu weyddiiyey,
Magacaa? Wuxuu ugu jawaabay, Waxaa lay yidhaahdaa,
Liijon, waayo, annagu waa badan nahay. 10 Aad buuna uga
baryay inaanu dalka ka eryin. 11 Buurta sinteedana waxaa
joogay daaqsin weyn oo doofaarro ah oo daaqaysa. 12
Jinniyadii oo dhan baa baryeen, oo waxay ku yidhaahdeen,
Noo dir doofaarrada inaannu galno. 13 Kolkiiba Ciise baa u
fasaxay. Markaasaa jinniyadii wasakhda lahayd baxeen,
oo waxay galeen doofaarrada, daaqsintiina jarka hoos bay
uga yacday ilaa badda, baddayna ku bakhtiyeen, waxayna
ahaayeen abbaaraha laba kun. 14 Markaasaa kuwii daajin
jiray carareen, oo dadkii magaalada iyo beerahaba ayay u
warrameen. Kolkaasaa dadkii u soo baxay inay arkaan wixii
dhacay. 15 Markaasay u yimaadeen Ciise, oo waxay arkeen
jinnoolihii isagoo fadhiya oo dhar sita oo miyir qaba, wayna
baqeen. 16 Kolkaasaa kuwii arkay waxay u sheegeen sidii ay
u dhacday jinnoolihii iyo warkii doofaarrada. 17 Markaasay
bilaabeen inay baryaan inuu soohdintooda ka noqdo. 18
Intuu doonnida fuulayay, kii jinniyada qabi jiray ayaa baryay
inuu raaco. 19 Ciisese uma fasaxin, laakiin wuxuu ku yidhi,
Gurigaaga iyo dadkaaga u tag oo u sheeg waxa weyn oo
Rabbigu kuu sameeyey iyo siduu kuugu naxariistay. 20
Kolkaasuu tegey oo bilaabay inuu Dekabolis ku naadiyo
waxa weyn oo Ciise u sameeyey, oo dhammaan bay la wada
yaabeen. 21 Markii Ciise haddana dhanka kale doonnida
ugu gudbay ayaa dad faro badan u soo ururay, isaguna
badda agteeda ayuu joogay. 22 Waxaa u yimid taliyayaasha
sunagogga midkood ee Yayros la odhan jiray, oo markuu
arkay, cagihiisa ayuu isku riday, 23 oo aad buu u baryay
oo ku yidhi, Gabadhaydii yarayd waa sakaraad. Waan ku
baryayaa, kaalay oo gacmahaaga saar inay bogsato oo
noolaato. 24 Markaasaa Ciise raacay, dad faro badanna waa
la socday, wayna cidhiidhiyeen. 25 Waxaa jirtay naag laba iyo
toban sannadood dhiigbixid qabtay. 26 Silec badanna ayay
dhakhtarro badan ka heshay, oo wixii ay lahayd oo dhanna
ayay ku bixisay, mana roonaanin laakiinse way ka sii dartay.
27 Markay Ciise warkiisa maqashay ayay dadkii soo dhex
martay oo dhabarkiisa timid, markaasay maradiisa taabatay.
28 Waayo, waxay tidhi, Haddaan dharkiisa iska taabto uun,
waan bogsanayaa. 29 Kolkiiba bixiddii dhiiggeeda ayaa
joogsatay oo waxay jidhkeedii ka garatay inay cudurkii ka
bogsatay. 30 Ciise kolkiiba wuxuu iska gartay in xoog ka
baxay isagii, oo intuu cidhiidhiga ku soo jeestay ayuu yidhi,
Yaa dharkayga taabtay? 31 Xertiisii ayaa ku tidhi, Adigu
waad aragtaa dadka badan oo ku cidhiidhinaya. Ma waxaad
na leedahay, Yaa i taabtay? 32 Kolkaasuu hareerihiisii ka
fiirfiiriyey inuu arko tan waxan samaysay. 33 Naagtiise
waa baqday oo gariirtay iyadoo garanaysa wixii loogu

sameeyey. Markaasay timid oo hortiisa ku dhacday oo runtii
oo dhan u sheegtay. **34** Kolkaasuu wuxuu iyada ku yidhi,
Gabadhay, rumaysadkaaga ayaa ku bogsiiyey. Nabad ku tag,
cudurkaagiina ka bogso. **35** Goortuu weli hadlayay waxaa
gurigii taliyaha sunagogga ka yimid kuwii yidhi, Gabadhaadii
waa dhimatay. Maxaad Macallinka u sii dhibaysaa? **36**
Mar alla markuu Ciise maqlay hadalka lagu hadlay, wuxuu
taliyaha sunagogga ku yidhi, Ha baqin ee iska rumayso. **37**
Ninnana uma oggolaanin inuu raaco, Butros, iyo Yacquub,
iyo Yooxanaa oo ahaa Yacquub walaalkiis, maahee. **38**
Kolkaasuu yimid gurigii taliyaha sunagogga, oo wuxuu arkay
buuqa iyo kuwa ooyaya oo aad u barooranaya. **39** Goortuu
galay wuxuu ku yidhi, Maxaad sidaas ugu buuqaysaan oo
u ooyaysaan? Gabadhu ma dhiman, waase huruddaa. **40**
Iyaguse aad bay ugu qosleen, laakiin goortuu kulligood
dibadda u saaray, wuxuu waday gabadhii aabbeheed iyo
hooyadeed iyo kuwii isaga la jiray, wuxuuna galay meeshii
gabadhu jiiftay. **41** Kolkaasuu gabadhii gacanteeda qabtay oo
ku yidhi, Talita qumi, taasoo micneheedu yahay, Gabadhay,
waxaan ku leeyahay, Kac. **42** Kolkiiba gabadhii waa kacday
oo socotay; waxay jirtay laba iyo toban sannadood. Dadkuna
aad bay ula wada yaabeen. **43** Aad buu ugu adkeeyey inaan
ninna ogaan, wuxuuna u sheegay in cunto la siiyo iyada.

**6** Meeshaas ayuu ka tegey oo waddankiisii yimid, xertiisiina
way soo raaceen. **2** Goortii sabtida la gaadhay ayuu
bilaabay inuu sunagogga wax ku baro; dad badan oo
maqlayaana way la yaabeen, oo waxay yidhaahdeen,
Ninkanu xaggee buu waxyaalahan ka helay? Oo xigmaddan
la siiyeyna maxay tahay in xataa shuqulladan oo xoogga leh
gacmihiisu sameeyaan? **3** Kanu miyaanu ahayn nijaarkii,
ina Maryan, kii walaal u yahay Yacquub, iyo Yoosee, iyo
Yuudas, iyo Simoon; gabdhihii walaalihiis ahaana miyaanay
inala wada joogin? Wayna ka xumaadeen. **4** Laakiin Ciise
wuxuu ku yidhi, Nebi murwad la' ma jiro, waddankiisa, iyo
dadkiisa, iyo gurigiisa dhexdooda maahee. **5** Meeshaas
shuqul xoog leh kuma samayn karin inuu dhawr buka
gacmihiisii saaro oo bogsiiyo mooyaane. **6** Wuuna ka yaabay
rumaysadla'aantooda aawadeed. Kolkaasuu tuulooyinka ku
wareegay isagoo wax baraya. **7** Kolkaasuu laba-iyo-tobankii
u yeedhay, wuxuuna bilaabay inuu laba laba u diro. Wuuna
siiyey amar ay jinniyo wasakh leh ku saaraan. **8** Wuxuuna
ku amray, Waxba safarka ha u qaadanina ul maahee. Kibis
iyo qandi iyo lacag kiishad ku jirta ha qaadanina. **9** Kabo
gashada, laakiin laba khamiis ha gashanina. **10** Wuxuuna ku
yidhi, Meel walba oo aad guri ka gashaan, halkaas jooga ilaa
aad ka tegaysaan. **11** Meel alla meeshaan idin soo dhowayn
oo aan idin maqlin, goortaad halkaas ka tegaysaan, siigada
cagihiinna ka dhabaandhaba inay marag ka gees ah ku
ahaato. **12** Markaasay baxeen oo waxay wacdiyeen dadkii si
ay u toobadkeenaan. **13** Jinniyo badan ayay saareen, dad
badan oo bukayna saliid bay mariyeen, wayna bogsiiyeen. **14**
Boqor Herodos ayaa warkii Ciise maqlay, waayo, magiciisa
ayaa meel walba laga wada ogaaday. Kolkaasuu yidhi,
Yooxanaa Baabtiisaha ayaa kuwii dhintay ka soo sara kacay,
sidaa darteeda shuqulladan xoogga leh waa ku dhex jiraan
oo shaqaynayaan. **15** Laakiin qaar kale waxay yidhaahdeen,
Waa Eliyaas; qaar kalena waxay yidhaahdeen, Waa nebi,
nebiyada kale la mid ah. **16** Laakiin Herodos goortuu maqlay
wuxuu yidhi, Kanu waa Yooxanaa, kii aan madaxa ka gooyay.
Kuwii dhintay ayuu ka soo sara kacay. **17** Waayo, Herodos
qudhiisa ayaa cid diray oo Yooxanaa qabtay oo u xabbisay
walaalkiis Filibos naagtiisii Herodiya aawadeed, waayo, wuu
guursaday, **18** oo Yooxanaa wuxuu Herodos ku yidhi, Xalaal
kuu ma aha inaad naagtii walaalkaa haysatid. **19** Sidaa
darteed ayaa Herodiya ka dhiriftay oo doonaysay inay disho,
mase karin, **20** waayo, Herodos baa Yooxanaa ka baqay.
Wuxuu ogaa inuu yahay nin qumman oo quduus ah, wuuna
ilaaliyey. Oo goortuu maqlay waa wareeray, farxadna wuu
ku maqlay. **21** Goortii maalin wanaagsan timid, markii la
xusuustay dhalashadii Herodos, ayuu diyaafad ugu yeedhay
raggiisii waaweynaa iyo saraakiishiisii iyo cuqaashii Galili.
**22** Kolkaasaa gabadhii Herodiya qudheedu soo gashay
oo cayaartay, oo waxay ka farxisay Herodos iyo kuwii la
fadhiyey, kolkaasaa boqorkii baa wuxuu gabadhii ku yidhi,
Wax alla wixii aad doonaysidba i weyddiiso, waanan ku
siinayaa. **23** Kolkaasuu wuxuu ugu dhaartay, Wax alla wixii
aad i weyddiisatidba, waan ku siinayaa ilaa boqortooyadayda
badhkeed. **24** Markaasay baxday oo hooyadeed ku tidhi,
Maxaan weyddiistaa? Oo waxay tidhi, Madaxa Yooxanaa
Baabtiisaha. **25** Kolkiiba boqorkii ayay dhaqso ugu timid oo
weyddiisatay iyadoo leh, Waxaan doonayaa haddaba madaxii
Yooxanaa Baabtiisaha inaad xeedho igu siiso. **26** Markaasaa
boqorkii aad u calool xumaaday, laakiin dhaarihiisii iyo kuwii
la fadhiyey aawadood ayuusan doonaynin inuu diido. **27**
Kolkiiba boqorkii wuxuu diray askari oo ku amray inuu
madaxiisa soo qaado. Markaasuu tegay oo xabsiga madaxa
kaga gooyay. **28** Madaxiisiina ayuu xeedho ku soo qaaday
oo gabadhii siiyey, gabadhiina waxay siisay hooyadeed. **29**
Tan goortii xertiisii maqashay, ayay yimaadeen oo meydkiisii
qaadeen oo aaseen. **30** Rasuulladii ayaa Ciise u soo ururay,
oo waxay u sheegeen wixii ay sameeyeen oo dhan iyo wixii
ay bareenba. **31** Markaasuu iyaga ku yidhi, Keligiin kaalaya
cidlada, waxoogaana ku nasta. Waayo, kuwii imanayay iyo
kuwii tegayay way badnaayeen, nefis ay wax ku cunaanna

ma lahayn. 32 Kolkaasay keli ahaantooda doonni raaceen
oo meel cidla' ah tageen. 33 Dadkii baase arkay iyagoo
tegaya, qaar badanna way garteen, oo magaalooyinka oo
dhan ayay ka soo ordeen, wayna ka dheereeyeen. 34
Ciise goortuu soo degay ayuu dad badan arkay, wuuna u
naxariistay, maxaa yeelay, waxay ahaayeen sidii ido aan
adhijir lahayn, wuxuuna bilaabay inuu wax badan baro. 35
Goortii maalintii hore u badatay ayaa xertiisii u timid oo ku
tidhi, Meeshu waa cidlo, haddana maalintii horay u badatay.
36 Dadka dir, si ay u tagaan beeraha iyo tuulooyinka ku
wareegsan, oo ay wax la cuno u soo iibsadaan. 37 Kolkaasuu
u jawaabay oo ku yidhi, Idinku siiya waxay cunaan. Waxay
ku yidhaahdeen, Miyaannu tagnaa inaannu soo iibinno laba
boqol oo dinaar oo kibis ah oo aannu siinno inay cunaan?
38 Markaasuu ku yidhi, Immisa kibsood baad haysaan?
Soo eega. Oo markay ogaadeen, waxay ku yidhaahdeen,
Shan kibsood iyo laba kalluun. 39 Kolkaasuu ku amray inay
cawska koox koox ugu fadhiisiyaan. 40 Waxay u fadhiisteen
safaf boqol boqol iyo konton konton ah. 41 Isaguna wuxuu
qaaday shantii kibsood iyo labadii kalluun, oo intuu cirka
eegay ayuu barakeeyey, kibistiina ayuu kala jejebiyey oo
xertiisii siiyey inay hortooda dhigaan, labadii kalluunna wuu u
qaybiyey giddigood. 42 Dhammaantood way wada cuneen,
oo ka dhergeen. 43 Oo waxay soo gureen laba iyo toban
dambiilood oo ka buuxa jajabkii iyo kalluunka. 44 Kuwii
kibistii cunayna waxay ahaayeen shan kun oo nin. 45
Kolkiiba wuxuu xertiisii ku amray inay doonnida fuulaan oo
ay hortiis tagaan dhanka kale oo Beytsayda intuu dadkii
badnaa dirayo. 46 Goortuu kala diray, ayuu buurta tegey inuu
ku tukado. 47 Goortii makhribkii la gaadhay, doonnidii waxay
joogtay badda dhexdeeda, isaguna keligiis ayuu dhulka
joogay. 48 Wuxuu arkay iyagoo wadidda ku dhibtoonaya,
waayo, dabaysha ayaa ka gees ahayd. Wakhtigii gaadhka
afraad oo habeenka ayuu u yimid isagoo badda ku dul socda,
wuuna iska dhaafi lahaa. 49 Laakiin goortay arkeen isagoo
badda ku dul socda, waxay moodeen inuu muuqasho yahay,
markaasay qayliyeen. 50 Waayo, way wada arkeen, wayna
nexeen. Markiiba wuu la hadlay oo ku yidhi, Kalsoonaada,
waa aniga ee ha baqina. 51 Markaasuu doonnidii iyaga ugu
tegey, dabayshuna waa joogsatay. Aad iyo aad bay u nexeen
oo ula yaabeen. 52 Waayo, iyaga kibistii waxba kama ay
garanin, maxaa yeelay, qalbigoodu waa engegnaa. 53 Oo
markay gudbeen waxay yimaadeen dalka Gennesared, oo
doonnidiina xeebtay ku xidheen. 54 Goortay doonnida ka
soo degeen, kolkiiba dadku way garteen isaga. 55 Oo waxay
orod ku wareegeen dalka u dhow oo dhan oo bilaabeen inay
kuwa buka sariiro ugu soo qaadaan meeshii ay ku maqleen
inuu joogo. 56 Meel alla meeshuu galayba, tuulooyinka ama
magaalooyinka ama beeraha, waxay suuqyada dhigeen
kuwa buka, oo ay ka baryeen inay faraqa maradiisa oo keliya
taabtaan, oo kuwii taabtay oo dhammuna way bogsadeen.

7 Kolkaasaa waxaa u soo urureen Farrisiintii iyo qaar
culimmo ah oo Yeruusaalem ka yimid. 2 Goortaasay
arkeen xertiisii qaarkooda oo kibis ku cunaya gacmo
nijaasaysan, waxa weeye gacmo aan dhaqnayn. 3 Waayo,
Farrisiinta iyo Yuhuudda oo dhammu waxba ma cunaan
haddayan gacmahooda aad u dhaqin, si ay u xajiyaan
xeerkii waayeellada. 4 Oo goortay suuqa ka yimaadaan
waxba ma cunaan, inay maydhaan maahee. Waxyaalo
badan oo kale ayaa jira oo ay heleen inay xajiyaan sida
dhaqidda koobab, iyo dheriyo, iyo weelal naxaas ah, iyo
miisas. 5 Markaasaa Farrisiintii iyo culimmadii weyddiiyeen
oo waxay ku yidhaahdeen, Xertaadii maxay ugu socon
waayeen xeerkii waayeellada, waxayse wax ku cunaan
gacmo nijaasaysan? 6 Markaasuu wuxuu ku yidhi, Isayos
aad buu wax idiinka sii sheegay, labawejiilayaalow, siday u
qoran tahay, Dadkanu bushimahooda ayay igu maamuusaan,
Laakiin qalbigoodu waa iga fog yahay. 7 Si aan micne
lahayn ayay ii caabudaan, Iyagoo dadka wax ku baraya
amarrada dadka. 8 Idinku qaynuunkii Ilaah waad ka tagtaan,
oo waxaad xajisaan xeerka dadka, sida dhaqidda dheriyada
iyo koobabka, oo wax kale oo badan oo kuwaas la mid ah
ayaad samaysaan. 9 Markaasuu ku yidhi, Qaynuunkii Ilaah
aad baad u diiddaan inaad xeerkiinna xajisaan. 10 Waayo,
Muuse wuxuu yidhi, Aabbahaa iyo hooyadaa maamuus;
oo kan aabbihii iyo hooyadii caayaa, dhimasho ha ku
dhammaado. 11 Laakiin waxaad leedihiin, Haddii nin aabbihii
iyo hooyadii ku yidhaahdo, Wixii aan idiin tari lahaa oo
dhan waa Qurbaan, waxa weeye, Waa sadaqad aan Ilaah
siiyey; 12 idinku uma daysaan mar dambe inuu aabbihii iyo
hooyadii wax u sameeyo. 13 Ereygii Ilaah ayaad ku buriseen
xeerkiinna aad bixiseen, oo wax badan oo kuwan oo kale ah
ayaad samaysaan. 14 Markaasuu dadkii badnaa haddana
u yeedhay oo ku yidhi, I maqla kulligiin oo garta. 15 Ma
jiraan wax dibadda jooga oo intay ninka galaan nijaasayn
karaa, laakiin waxa isaga ka soo baxa kuwaasaa waxa ninka
nijaaseeya. 16 Haddii nin dhego wax lagu maqlo leeyahay ha
maqlo. 17 Markuu dadka ka tegey oo guri galay ayaa xertiisii
masaalladii wax ka weyddiisay. 18 Wuxuu iyaga ku yidhi,
Idinkuna ma sidaasaad garashola'aan u tihiin? Miyaydnaan
garanaynin in waxa dibadda joogaa oo dadka galaa ayan
nijaasayn karin? 19 Waayo, qalbigiisa ma galaan, laakiin
calooshiisay galaan, oo waxay ku dhacaan meesha lagu

saxaroodo. Sidaasuu cuntada oo dhan ku nadiifiyey. 20
Wuxuuna ku yidhi, Waxa ninka ka soo baxa, kuwaas weeye
waxa ninka nijaaseeyaa. 21 Waayo, waxan weeye waxa
qalbiga dadka gudihiisa ka soo baxa fikirrada shar leh, iyo
galmada xaaraanta ah, iyo tuuganimada, iyo dilidda, 22
iyo damacnimada, iyo sharka, iyo khiyaanada, iyo camal
xumaanta, iyo il xun, iyo cayda, iyo kibirka, iyo nacasnimada.
23 Waxyaalahan shar leh oo dhammu gudahay ka soo
baxaan oo ninka nijaaseeyaan. 24 Meeshaas ayuu ka kacay
oo wuxuu tegey soohdimaha Turos iyo Siidoon. Markaasuu
guri galay. Ma uu doonaynin in la ogaado, laakiin wuu
qarsoomi kari waayay. 25 Kolkaasaa naag gabadheedu jinni
wasakh leh qabtay ayaa warkiisa maqashay, oo intay timid
ayay lugihiisa isku tuurtay. 26 Naagtii waxay ahayd Gariig,
qolo ahaanna Surofoynike. Oo waxay ka bariday inuu jinniga
gabadheeda ka saaro. 27 Kolkaasuu ku yidhi, Kolka hore
carruurtu ha dheergaan, waayo, ma wanaagsana in carruurta
kibistooda la qaado oo eeyaha loo tuuro. 28 Laakiin way
u jawaabtay oo ku tidhi, Waa run, Sayidow, laakiin weliba
eeyaha miiska hoostiisa ku jiraa waxay cunaan jajabka
carruurta ka dhaca. 29 Kolkaasuu iyada ku yidhi, Hadalkaas
aawadiis tag; jinnigii ayaa gabadhaada ka baxay. 30 Goortay
gurigeeda timid waxay aragtay gabadhii oo sariirta jiifta oo
jinnigii ka baxay. 31 Mar kale ayuu soohdimaha Turos ka soo
tegey oo Siidoon maray oo badda Galili yimid, soohdimaha
Dekabolisna ayuu soo dhex maray. 32 Markaasay waxay u
keeneen mid dhego iyo carrab la', waxayna ka baryeen inuu
gacantiisa saaro. 33 Kolkaasuu dadkii badnaa dhinaca uga
bixiyey, oo farihiisa ayuu dhegihiisa ka geliyey, wuuna tufay
oo carrabkiisa taabtay. 34 Markaasuu cirka kor u eegay,
wuuna taahay oo ku yidhi, Efata, waxa weeye, Furan. 35
Markiiba dhegihiisa waa furmeen oo carrabkiisii xidhnaa
waa debcay, oo si bayaan ah ayuu u hadlay. 36 Wuuna
ku amray inaanay ninna u sheegin; laakiin in alla intuu
amray, ayay in ka badan sii naadiyeen. 37 Aad iyo aad bay
ula yaabsanaayeen, oo waxay yidhaahdeen, Wax walba si
wanaagsan ayuu u sameeyey. Kuwa dhegaha la' wax buu
maqashiiyaa, kuwa carrabka la'na wax buu ka hadliyaa.

8 Maalmahaas dadkii aad buu u badnaa oo waxay cunaanna
ma haysan, markaasaa Ciise xertiisii u yeedhay oo ku
yidhi, 2 Dadka badan ayaan u naxariisanayaa, waayo, durba
saddex maalmood ayay ila joogeen, oo waxay cunaanna
ma haystaan. 3 Haddii aan guryahooda u diro, iyagoo
sooman, jidkay ku itaalbeeli doonaan, waayo, qaarkood
waxay ka yimaadeen meel fog. 4 Kolkaasaa xertiisii u
jawaabtay, oo waxay ku yidhaahdeen, Meeshan cidlada ah
xaggee looga heli karaa kibis dadkanu ka dhergaan? 5
Goortaasuu weyddiiyey, Immisa kibsood baad haysaan?
Waxay ku yidhaahdeen, Toddoba. 6 Kolkaasuu dadkii badnaa
ku amray inay dhulka fadhiistaan. Markaasuu toddobadii
kibsood soo qaaday, oo goortuu ku mahadnaqay ayuu
kala jejebiyey oo xertiisii siiyey inay hortooda dhigaan.
Markaasay dadkii badnaa hor dhigeen. 7 Waxay haysteen
in yar oo kalluun yaryar ah. Oo intuu barakeeyey, wuxuu
ku amray inay kuwaasna hortooda dhigaan. 8 Markaasay
cuneen oo dhergeen; kolkaasay soo ururiyeen toddoba
dambiilood oo ka buuxa jajabkii hadhay. 9 Kuwii cunayna
waxay ku dhowaayeen afar kun, markaasuu diray. 10
Kolkiiba xertiisii ayuu doonni la fuulay, oo wuxuu yimid
dhinacyada Dalmanuuta. 11 Markaasaa Farrisiintu u soo
baxday, oo waxay bilaabeen inay wax weyddiiyaan, oo
waxay ka doonayeen inuu calaamo cirka ka tuso, si ay u
jirrabaan. 12 Intuu ruuxiisa ka taahay ayuu yidhi, Qarnigan
muxuu calaamo u doondoonayaa? Runtii waxaan idinku
leeyahay, Qarnigan calaamo lama siin doono. 13 Markaasuu
ka tegey oo haddana doonniduu fuulay oo dhanka kale u
kacay. 14 Xertii waxay illoobeen inay kibis soo qaataan,
oo doonnida kibis kuma ay haysan mid keliya maahane.
15 Markaasuu wuxuu ku amray, oo ku yidhi, Iska eega
oo iska jira khamiirka Farrisiinta iyo khamiirka Herodos.
16 Markaasay isla wada hadleen, oo isku yidhaahdeen,
Sababtaasu waa kibistii aannan haysan aawadeed. 17
Ciise oo gartay ayaa ku yidhi, Maxaad isu la hadlaysaan?
Ma kibistii aydnaan haysan aawadeed ba? Miyaydnaan
weli arkin oo aydnaan garanaynin? Qalbigiinnu weli ma
engegan yahay? 18 Indho baad leedihiin, miyaydnaan waxba
arkaynin? Dhegona waad leedihiin, miyaydnaan waxba
maqlaynin oo aydnaan xusuusnayn? 19 Goortii aan shantii
kibsood shantii kun u kala jejebiyey, immisa dambiilood oo
jajab ka buuxa ayaad soo ururiseen? Waxay ku yidhaahdeen,
Laba iyo toban. 20 Oo goortii aan toddobadii kibsood afartii
kun u kala jejebiyey, immisa dambiilood oo jajab ka buuxa
ayaad soo ururiseen? Waxay ku yidhaahdeen, Toddoba.
21 Wuxuuna ku yidhi, Miyaydnaan weli garanaynin? 22
Markaasay yimaadeen Beytsayda. Oo waxay u keeneen
nin indha la' oo ay ka baryeen inuu taabto. 23 Markaasuu
ninkii indhaha la'aa gacanta qabtay, oo tuulada dibadda
uga saaray, oo goortuu indhaha kaga tufay oo gacmihiisii
saaray, wuxuu weyddiiyey, Wax ma arkaysaa? 24 Kor buu u
eegay oo yidhi, Waxaan arkayaa niman, oo waxay ii le'eg
yihiin sida geedo socda. 25 Kolkaasuu mar kale gacmihiisii
indhaha ka saaray. Markaasuu aad iyo aad wax u eegay,
wuuna bogsaday, oo wax walba bayaan buu u arkay. 26

Kolkaasuu gurigiisii u diray, oo wuxuu ku yidhi, Tuulada
ha gelin. 27 Markaasaa Ciise iyo xertiisii waxay tageen oo
galeen tuulooyinka Kaysariya Filibos. Xertiisii ayuu jidka ku
weyddiiyey, oo wuxuu ku yidhi, Dadku yay igu sheegaan?
28 Waxay yidhaahdeen, Yooxanaa Baabtiisaha, qaarna,
Eliyaas, qaar kalena, Nebiyada midkood. 29 Markaasuu
weyddiiyey, oo wuxuu ku yidhi, Idinkuse yaad igu sheegtaan?
Butros ayaa u jawaabay oo wuxuu ku yidhi, Waxaad tahay
Masiixa. 30 Markaasuu ku amray inayan ninna isaga u
sheegin. 31 Kolkaasuu bilaabay inuu baro inay waajib ugu
tahay Wiilka Aadanahu inuu wax badan ku xanuunsado,
oo ay waayeellada iyo wadaaddada sare iyo culimmadu
diidaan, oo la dilo, oo saddex maalmood dabadeed uu soo
sara kaco. 32 Hadalkaas bayaan buu ugu hadlay. Markaasaa
Butros gees u waday oo bilaabay inuu canaanto. 33 Laakiin
Ciise markuu soo jeestay oo xertiisii eegay, ayuu Butros
canaantay, oo wuxuu ku yidhi, Gadaal iga mar, Shayddaan
yahow, waayo, waxyaalaha Ilaah kama fikirtid, waxaadse ka
fikirtaa waxyaalaha dadka. 34 Goortaasuu dadkii badnaa u
yeedhay iyo xertiisiiba oo wuxuu ku yidhi, Mid uun hadduu
doonayo inuu iga daba yimaado, ha dayriyo doonistiisa,
iskutallaabtiisana ha soo qaato oo ha i soo raaco. 35 Kan
doonaya inuu naftiisa badbaadiyo, waa lumin doonaa, laakiin
kan naftiisa u lumiya aawaday iyo injiilka aawadii, kaasaa
badbaadin doona. 36 Waayo, nin maxay u taraysaa hadduu
dunida oo dhan helo oo uu naftiisa lumiyo? 37 Nin muxuu
u bixiyaa naftiisa beddelkeeda? 38 Haddaba ku alla kii
qarnigan dembiga iyo sinada leh kaga xishooda aniga iyo
hadalkaygaba, Wiilka Aadanaha ayaa ka xishoon doona
isaga markuu ammaantii Aabbihiis kula yimaado malaa'igaha
quduuska ah.

**9** Wuxuu iyaga ku yidhi, Runtii waxaan idinku leeyahay,
Kuwa halkan taagan qaarkood sinaba dhimasho uma
dhadhamin doonaan ilaa ay arkaan boqortooyada Ilaah oo
xoog ku imanaysa. 2 Lix maalmood dabadeed Ciise wuxuu
waday Butros iyo Yacquub iyo Yooxanaa; oo wuxuu keligood
geeyey buur dheer, hortoodana ayuu ku beddelmay. 3
Dharkiisu aad buu caddaan ula dhalaalay sidii midka dhulka
wax ku caddeeya aanu u caddayn karin. 4 Markaasaa
waxaa iyaga u muuqday Eliyaas iyo Muuseba, waxayna
la hadlayeen Ciise. 5 Markaasaa Butros la hadlay oo
Ciise ku yidhi, Macallimow, waxaa inoo wanaagsan inaynu
halkan joogno. Saddex waab aannu ka dhisno, mid adaan
kuu dhisaynaa, midna Muuse, midna Eliyaas. 6 Waayo,
ma uu garanaynin wuxuu ku jawaabo, maxaa yeelay, aad
bay u baqeen. 7 Kolkaasaa waxaa timid daruur oo iyaga
hadhaynaysa, daruurtiina waxaa ka yimid cod leh, Kanu
waa Wiilkayga aan jeclahay ee maqla isaga. 8 Dhaqsiba
goortii ay hareerahooda fiiriyeen, mar dambe ma ay arkin
cid kale oo iyaga la joogta Ciise keliya maahee. 9 Markay
buurta ka soo degayeen, wuxuu ku amray inaanay ninna
u sheegin waxay arkeen intaanu Wiilkii Aadanahu kuwii
dhintay ka soo sara kicin. 10 Dhexdoodii ayay hadalkii
haysteen oo iska weyddiinayeen, Waa maxay ka soo sara
kiciddii kuwii dhintay? 11 Markaasay waxay weyddiiyeen oo
ku yidhaahdeen, Culimmadu maxay u yidhaahdaan, Eliyaas
waa inuu horta yimaado? 12 Markaasuu u jawaabay oo ku
yidhi, Waa run in Eliyaas horta imanayo oo wax walba soo
celinayo. Oo sidee uga qoran tahay xagga Wiilka Aadanaha
inuu wax badan ku xanuunsan doono oo la nici doono? 13
Laakiin waxaan idinku leeyahay, Eliyaas waa yimid, oo wax
kasta oo ay doonayeen ayay ku sameeyeen siday uga qoran
tahay. 14 Markay xertii u yimaadeen, waxay arkeen dad faro
badan oo la jooga. Culimmaduna wax bay weyddiinayeen.
15 Kolkiiba dadkii badnaa markay isaga arkeen aad bay u
yaabeen oo ku soo ordeen oo nabdaadiyeen. 16 Kolkaasuu
weyddiiyey, Maxaad isweyddiinaysaan? 17 Markaasaa
dadkii badnaa midkood wuxuu ugu jawaabay, Macallimow,
waxaan kuu keenay wiilkayga jinni carrab la' qaba. 18
Meel alla meeshuu ku qabtoba, wuu ridaa; markaasuu
afka ka xumbeeyaa, wuuna ilka jirriqsadaa oo qallalaa.
Waxaan xertaada ka baryay inay ka saaraan, wayna kari
waayeen. 19 Markaasuu u jawaabay oo ku yidhi, Qarni
yahow rumaysadka daranu! Ilaa goormaan idinla jiri doonaa?
Ilaa goormaan idiin dulqaadan doonaa? Ii keena isaga. 20
Markaasay u keeneen. Goortuu arkay, kolkiiba jinnigii waa
gilgilay; dhulkuuna ku dhacay oo laballegdeeyey isagoo afka
ka xumbaynaya. 21 Markaasuu aabbihiis weyddiiyey, Intee
buu waxan qabay? Kolkaasuu yidhi, Tan iyo yaraantiisii. 22
Marar badan wuxuu ku tuuray dab iyo biyo inuu dumiyo,
laakiin haddaad wax samayn kartid, noo naxariiso oo na
caawi. 23 Ciise wuxuu ku yidhi, Haddaad rumaysan karaysid,
wax waluba waa u suurtoobaan ka rumaysan. 24 Kolkiiba
wiilka aabbihiis ayaa qayliyey oo oohin ku yidhi, Sayidow,
waan rumaysanahay, iga caawi rumaysaddarradayda. 25
Ciise goortuu arkay dadkii oo u soo ordaya, ayuu jinnigii
wasakhda lahaa canaantay oo ku yidhi, Jinni yahow carrabka
iyo dhegaha la'u, waxaan kugu amrayaa, Ka soo bax oo
kol dambena ha ku noqon. 26 Jinnigii intuu qayliyey, aad
buu u gilgilay, kolkaasuu ka soo baxay. Markaasuu wiilku
noqday sidii mid dhintay oo kale, sidaa darteeda dad badan
baa yidhi, Waa dhintay. 27 Laakiin Ciise ayaa gacanta
qabtay oo kiciyey; markaasuu kacay. 28 Ciise goortuu

guriga galay, xertiisii waxay gooni ahaan u weyddiiyeen,
Annagu maxaannu u saari kari waynay? **29** Wuxuu ku yidhi,
Caynkanu wax kale kuma soo bixi karo tukasho iyo soon
maahee. **30** Markaasay halkaas ka tageen oo Galili dhex
mareen, mana uu doonaynin in la ogaado. **31** Waayo, xertiisii
ayuu wax barayay, oo wuxuu ku yidhi, Wiilka Aadanaha
ayaa dadka loo gacangelinayaa, wayna dili doonaan oo
markii la dilo, saddex maalmood dabadeed, ayuu sara
kici doonaa. **32** Laakiin hadalkaas ayay garan waayeen,
wayna ka cabsadeen inay weyddiiyaan. **33** Markaasuu yimid
Kafarna'um, oo intuu gurigii joogay ayuu weyddiiyey, Maxaad
ka wada hadlayseen intaad jidka ku soo socoteen? **34**
Laakiin way aamuseen, waayo, intay jidka ku socdeen waxay
ka wada hadlayeen kan ugu weyn. **35** Intuu fadhiistay laba-
iyo-tobankii ayuu u yeedhay oo ku yidhi, Haddii qof doonayo
inuu dadka u horreeyo, isagaa ugu wada dambayn doona,
midiidin buuna u wada noqon doonaa. **36** Ilmo yar ayuu
qaaday oo dhexdooda joojiyey, oo goortuu gacmihiisii ku soo
qaaday ayuu iyaga ku yidhi, **37** Ku alla kii carruurta kan la
mid ah midkood magacayga ku aqbalaa, wuu i aqbalaa, oo
ku alla kii i aqbalaa, ima aqbalo, wuxuuse aqbalaa kan i soo
diray. **38** Yooxanaa baa u jawaabay oo ku yidhi, Macallimow,
waxaannu aragnay qof magacaaga jinniyo ku saaraya. Nama
uu soo raaco. Waannu u diidnay, waayo, isagu nama uu
soo raaco. **39** Laakiin Ciise baa yidhi, Ha u diidina, waayo,
ninna ma jiro oo yaab xoog leh magacayga ku sameeyaa
oo dhaqso hadal xun iga odhan karaa. **40** Waayo, kan aan
inaga gees ahayn waa inala gees. **41** Ku alla kii koob biyo
ah magacayga idinku siiyaa, maxaa yeelay, waxaad tihiin
kuwa Masiix, runtii waxaan idinku leeyahay, Abaalkiisuu ka
lumi maayoba. **42** Ku alla kii xumeeya yaryarkan i rumaystay
midkood, waxaa u roon in dhagaxshiid luqunta looga lalmiyo
oo badda lagu tuuro. **43** Haddii gacantaadu ku xumayso,
iska jar; waxaa kuu wanaagsan inaad gacanla'aan nolosha
ku gashid intii aad adigoo laba gacmood leh ula tegi lahayd
jahannamada ee ah dabkii aan la demin karayn **(Geenna g1067)**
**44** oo ah meeshii dixirigoodu uusan dhimanayn, dabkuna
uusan ka demayn. **45** Cagtaaduna hadday ku xumayso,
iska jar. Waxaa kuu wanaagsan inaad lugla'aan nolosha
ku gashid intii adigoo laba cagood leh lagugu tuuri lahaa
jahannamada **(Geenna g1067)** **46** oo ah meeshii dixirigoodu
uusan dhimanayn, dabkuna uusan ka demayn. **47** Haddii
ishaadu ku xumayso, iska bixi. Waxaa kuu wanaagsan inaad
boqortooyada Ilaah gashid adigoo il keliya leh intii adigoo
laba indhood leh lagugu tuuri lahaa jahannamada **(Geenna
g1067)** **48** oo ah meeshii dixirigoodu uusan dhimanayn,
dabkuna uusan ka demayn. **49** Waayo, mid walba dab baa
lagu cusbayn doonaa. **50** Cusbadu waa wanaagsan tahay,
laakiin cusbadu hadday dhadhan beesho, maxaad wax ku
cusbaynaysaan? Cusbo isku lahaada, nabadna isu ahaada.

**10** Meeshaasuu ka soo kacay oo wuxuu galay soohdimaha
Yahuudiya oo Webi Urdun ka shisheeya. Mar kale
dadkii badnaa baa u soo ururay, oo sida caadadiisu ahaan
jirtay, ayuu haddana wax baray. **2** Markaasaa Farrisiintu u
timid oo weyddiisay, Ma xalaal baa in nin naagtiisa furo?
Wayna jirrabayeen. **3** Kolkaasuu u jawaabay oo ku yidhi,
Muuse muxuu idinku amray? **4** Waxay yidhaahdeen, Muuse
waa fasaxay in warqaddii furniinta la dhigo oo la furo. **5**
Ciisena wuxuu u jawaabay oo ku yidhi, Qalbi engegnaantiinna
aawadeed ayuu amarkaas idiinku dhigay. **6** Laakiin tan iyo
bilowgii abuurniinta, Ilaah wuxuu sameeyey lab iyo dhaddig.
**7** Sababtaas aawadeed nin wuxuu ka tegayaa aabbihiis
iyo hooyadiis, wuxuuna la joogayaa naagtiisa. **8** Labaduba
waxay noqonayaan isku jidh. Sidaa darteed haatan iyagu
laba ma aha, laakiin waa isku jidh. **9** Haddaba wixii Ilaah
isku xidhay ninna yaanu kala furin. **10** Goortay guriga ku
jireen, xertiisii ayaa haddana waxaas wax ka weyddiiyeen.
**11** Markaasuu wuxuu ku yidhi, Ku alla kii naagtiisa furaa oo
mid kale guursadaa ayaa ka sinaysta. **12** Naagna haddii ay
ninkeeda furto oo mid kale guursato ayay sinaysataa. **13** Ilmo
yaryar ayay u keeneen inuu taabto, xertuna way canaanatay.
**14** Laakiin Ciise goortuu arkay, wuu cadhooday, oo wuxuu ku
yidhi, Ilmaha yaryar daaya, ha ii yimaadeene, hana diidina,
waayo, kuwan oo kale ayaa ka mid ah boqortooyada Ilaah. **15**
Runtii waxaan idinku leeyahay, Ku alla kii aan boqortooyada
Ilaah u aqbalin sida ilmo yar oo kale, meeshaas ma uu geli
doono. **16** Gacmihiisuu ku qaaday oo intuu calaacalihiisa
saaray, ayuu barakeeyey. **17** Goortuu jidka u soo baxay, mid
baa ku soo orday oo intuu u jilba joogsaday ayuu weyddiiyey
oo ku yidhi, Macallin wanaagsanow, maxaan sameeyaa
inaan nolosha weligeed ah dhaxlo? **(aiōnios g166)** **18** Ciise
wuxuu ku yidhi, Maxaad iigu yeedhaysaa, Wanaagsanow?
Mid wanaagsan ma jiro mid maahee, kaasuna waa Ilaah.
**19** Qaynuunnada waad taqaan. Waa inaanad sinaysan,
Waa inaanad qudh gooyn, Waa inaanad waxba xadin,
Waa inaanad marag been ah furin, Waa inaanad waxba
dulmin, Aabbahaa iyo hooyadaana maamuus. **20** Wuxuu u
jawaabay oo ku yidhi, Macallimow, kuwaas oo dhan tan iyo
yaraantaydii ayaan dhawrayay. **21** Markaasaa Ciise intuu
eegay jeclaaday oo ku yidhi, Wax keliya ayaa kuu dhiman.
Tag oo iibi waxaad haysatid oo dhan, oo masaakiintana sii,
oo waxaad jannada ku lahaan doontaa maal; ee kaalay oo
i soo raac. **22** Hadalkaas ayuu ka qulbay, wuuna baxay

isagoo calool xun, waayo, wuxuu ahaa mid waxyaalo badan
leh. 23 Ciise ishuu wada mariyey oo xertiisu ku yidhi, Kuwa
hodanka ah waa ku adag tahay inay boqortooyada Ilaah
galaan! 24 Xertiisii hadalladiisii bay ka yaabeen. Laakiin Ciise
mar kaluu u jawaabay oo ku yidhi, Ilma yahow, siday ugu
adag tahay kuwa maalka isku halleeya inay boqortooyada
Ilaah galaan! 25 Nin hodan ah inuu boqortooyada Ilaah galo
waxaa ka hawl yar in awr irbad daloolkeed ka duso. 26
Aad bay u yaabeen, waxayna isku lahaayeen, Haddaba
yaa badbaadi kara? 27 Markaasaa Ciise eegay oo ku
yidhi, Waxanu uma suurtoobaan dadka, waxbase uma aha
Ilaah, waayo, wax waluba waa u suurtoobaan Ilaah. 28
Kolkaasaa Butros bilaabay inuu ku yidhaahdo, Annagu wax
walba waannu ka wada tagnay, waana ku raacnay. 29 Ciise
wuxuu ku yidhi, Runtii waxaan idinku leeyahay, Ma jiro nin
aawaday iyo injiilka aawadiis uga tegey guri, ama walaalo,
ama hooyo, ama aabbe, ama carruur, ama beero, 30 oo
aan haatan oo la joogo helayn boqol laab guryo ah, iyo
walaalo, iyo hooyooyin, iyo carruur, iyo beero, wuxuuna la
heli doonaa silec, wakhtiga imanayana nolosha weligeed ah.
**(aiōn g165, aiōnios g166)** 31 Laakiin kuwa badan oo hore waa
dambayn doonaan, kuwa dambena waa horrayn doonaan.
32 Waxay ku socdeen jidka xaggii Yeruusaalem, Ciisena
waa hor marayay. Wayna yaabeen oo intay daba socdeen
way baqeen. Kolkaasuu laba-iyo-tobankii haddana waday
oo bilaabay inuu u sheego waxa isaga ku dhici doona, 33
oo wuxuu ku yidhi, Waxaynu ku soconnaa Yeruusaalem.
Wiilka Aadanaha waxaa loo dhiibi doonaa wadaaddada sare
iyo culimmada; oo waxay ku xukumi doonaan dhimasho.
Waxayna u dhiibi doonaan dadka aan Yuhuudda ahayn.
34 Wayna ku kajami doonaan, oo ku tufi doonaan, oo
karbaashi doonaan, wayna dili doonaan, saddex maalmood
dabadeedna wuu soo sara kici doonaa. 35 Waxaa u yimid
Yooxanaa iyo Yacquub oo ahaa wiilashii Sebedi, oo waxay
ku yidhaahdeen, Macallimow, waxaannu doonaynaa inaad
noo yeeshid wixii aannu weyddiisanno. 36 Wuxuu ku yidhi,
Maxaad doonaysaan inaan idiin sameeyo? 37 Waxay ku
yidhaahdeen, Na sii inaannu fadhiisanno mid midigtaada, kii
kalena bidixdaada xaggii ammaantaada. 38 Laakiin Ciise
wuxuu ku yidhi, Garan maysaan waxaad weyddiisanaysaan.
Ma karaysaan inaad ka cabtaan koobka aan ku dhowahay
inaan ka cabbo, iyo in laydinku baabtiiso baabtiiska laygu
baabtiisay? 39 Waxay ku yidhaahdeen, Waannu karaynaa.
Markaasaa Ciise ku yidhi, Koobka aan ka cabbayo waad
ka cabbi doontaan, oo baabtiiska laygu baabtiisay waa
laydinku baabtiisi doonaa, 40 laakiin inaad midigtayda
iyo bidixdayda fadhiisataan anigu ma lihi inaan idin siiyo,
laakiin waxaa la siin doonaa kuwa loo diyaargareeyey.
41 Tobankii goortay taas maqleen waxay bilaabeen inay
Yacquub iyo Yooxanaa u cadhoodaan. 42 Laakiin Ciise baa
u yeedhay oo ku yidhi, Idinku waad garanaysaan in kuwa
loo malaynayo inay quruumaha madaxdooda yihiin ay u
taliyaan, oo kuwooda u waaweynna ay xukun ku leeyihiin.
43 Laakiin sidaasu dhexdiinna ma aha, laakiin ku alla kii
doonaya inuu dhexdiinna u weynaado, midiidinkiinna waa
inuu ahaado, 44 oo ku alla kii doonaya inuu idiin horreeyo,
kulli waa inuu addoon u ahaado. 45 Waayo, Wiilka Aadanahu
uma iman in loo adeego laakiin inuu adeego iyo inuu naftiisa
dad badan furashadooda u bixiyo. 46 Kolkaasay yimaadeen
Yerixoo, oo goortuu Yerixoo ka soo baxayay, isaga iyo
xertiisii iyo dad faro badanba, nin indha la' oo Bartimayos la
odhan jiray, oo ina Timayos ahaa, ayaa jidka ag fadhiyey oo
dawarsanayay. 47 Goortuu maqlay inuu yahay Ciisihii reer
Naasared, wuxuu bilaabay inuu aad u qayliyo oo yidhaahdo,
Ciise, ina Daa'uudow, ii naxariiso. 48 Qaar badan baa
canaantay si uu u aamuso, laakiin si ka badan ayuu ugu
qayliyey, Ina Daa'uudow, ii naxariiso. 49 Kolkaasaa Ciise
joogsaday oo yidhi, U yeedha. Markaasay ninkii indhaha
la'aa u yeedheen oo ku yidhaahdeen, Kalsoonow, kac, waa
kuu yeedhayaaye. 50 Intuu maradiisa iska tuuray ayuu
booday oo Ciise u yimid. 51 Ciise ayaa u jawaabay oo ku
yidhi, Maxaad doonaysaa inaan kuu sameeyo? Indhoolihii
baa ku yidhi, Sayidow, inaan wax arko. 52 Markaasaa Ciise
ku yidhi, Soco. Rumaysadkaaga ayaa ku bogsiiyey. Kolkiiba
ayuu wax arkay, oo jidka buu la qaaday isaga.

## 11

Goortay Yeruusaalem ku soo dhowaadeen, halka
Beytfaage iyo Beytaniya, xaggii Buur Saytuun, xertiisii
ayuu laba ka diray. 2 Wuxuuna ku yidhi, Tuulada idinka
soo hor jeedda taga, oo kolkiiba markaad gashaan waxaad
ka helaysaan qayl xidhan oo aan ninna weligii fuulin. Soo
fura oo keena. 3 Haddii nin idinku yidhaahdo, Maxaad
waxan u samaynaysaan? waxaad ku tidhaahdaan, Sayidkaa
u baahan, oo kolkiiba wuu u soo diri doonaa halkan. 4
Markaasay tageen oo heleen qayl ku xidhan irid agteed meel
dibadda ah oo jidka dhexdiisaa, wayna soo fureen. 5 Kuwa
halkaa taagnaa qaarkood waxay ku yidhaahdeen, Maxaad
samaynaysaan oo u furaysaan qaylka? 6 Kolkaasay waxay
ku yidhaahdeen sida Ciise u amray, markaasay oggolaadeen.
7 Waxay qaylkii u keeneen Ciise, dharkoodana ayay dusha ka
saareen, wuuna ku fadhiistay. 8 Dad badan baa dharkoodii
jidka ku goglay, kuwa kalena laamo ayay beeraha ka soo
jareen oo jidka ku gogleen. 9 Kuwii hor socday iyo kuwii
daba socdayba way qayliyeen oo yidhaahdeen, Hoosanna,
waxaa barakaysan kan Rabbiga magiciisa ku imanayo. 10

Waxaa barakaysan boqortooyada imanaysa oo aabbeheen
Daa'uud. Hoosanna ha ku jirto meelaha ugu sarreeya. **11**
Markaasaa Ciise Yeruusaalem yimid oo galay macbudka.
Goortuu hareeraha iyo wax walbaba eegay, oo gabbalkiina
dhacay, ayuu Beytaniya laba-iyo-tobankii ula baxay. **12**
Maalintii dambe, markay Beytaniya ka yimaadeen, wuu
gaajaysnaa. **13** Meel fog wuxuu ka arkay geed berde ah
oo caleen leh. Wuu u yimid inuu haddana wax ka helo.
Goortuu u yimid waxba kama uu helin caleemo keliya
maahee, waayo, wakhtigii berdaha ma ahayn. **14** Ciise baa
u jawaabay oo geedkii ku yidhi, Hadda dabadeed weligaa
ninna yuu midho kaa cunin. Xertiisiina waa maqashay. **(aiōn**
**g165)** **15** Waxay yimaadeen Yeruusaalem. Ciisena macbudka
ayuu galay oo bilaabay inuu ka eryo kuwii macbudkii wax
ku iibinayay iyo kuwii wax ka iibsanayay. Wuxuuna rogay
miisaskii kuwii lacagta bedbeddelayay iyo kursiyadii kuwii
qoolleyaha iibinayay. **16** Umana oggolayn in ninna alaab
macbudka la soo dhex maro. **17** Markaasuu wax baray oo
ku yidhi, Miyaanay qornayn, Gurigayga waxaa quruumaha
oo dhan loogu yeedhi doonaa guriga tukashada? Idinkuse
waxaad ka dhigteen god tuugo. **18** Markii wadaaddadii sare
iyo culimmadii maqleen, waxay doonayeen si ay u dilaan,
waayo, way ka baqeen, maxaa yeelay, dadka oo dhan waxay
ka yaabeen waxbariddiisa. **19** Mar alla markii qorraxdu
dhacday ayay magaalada ka baxeen. **20** Subaxdii goortay
ag marayeen, waxay arkeen geedkii berdaha ahaa oo
xididdada ka engegay. **21** Markaasaa Butros soo xusuustay,
oo wuxuu ku yidhi, Macallinkaygiiyow, eeg, geedkii berdaha
ahaa oo aad habaartay waa engegay. **22** Ciise baa u
jawaabay oo ku yidhi, Ilaah rumaysta. **23** Runtii waxaan
idinku leeyahay, Ku alla kii buurtan ku yidhaahda, Ruq,
baddana isku tuur, oo aan qalbigiisana ka shakiyin laakiin
rumaysta in wuxuu yidhi ay noqonayso, waa u ahaan
doontaa. **24** Sidaa darteed, waxaan idinku leeyahay, wax
kasta oo aad tukasho ku baridaan, rumaysta inaad hesheen
oo way idiin ahaan doontaa. **25** Oo kolkaad tukasho u taagan
tihiin, cafiya haddii aad dad wax ku leedihiin, si Aabbihiinna
jannada ku jiraa xumaantiinna idiin cafiyo. **26** Haddii aanad
cafiyin, Aabbihiinna jannada ku jira xumaantiinna idiin cafiyi
maayo. **27** Mar kale ayay Yeruusaalem yimaadeen. Oo
goortuu macbudkii dhex marayay waxaa u yimid wadaaddadii
sare iyo culimmadii iyo waayeelladii. **28** Markaasay waxay
ku yidhaahdeen, Amarkee baad waxan ku samaysaa?
Yaa amarkan ku siiyey inaad waxan ku samayso? **29**
Ciise ayaa u jawaabay oo ku yidhi, Aniguna hal baan
idin weyddiinayaa, ii jawaaba, waanan idiin sheegi doonaa
amarka aan waxan ku sameeyo. **30** Baabtiiskii Yooxanaa ma
wuxuu ka yimid xagga jannada mise dadka? Ii jawaaba.
**31** Dhexdooda ayay iskala hadleen iyagoo leh, Maxaynu
nidhaahnaa? Haddaynu nidhaahno, Xagga jannada, wuxuu
inagu odhanayaa, Haddaba maxaad u rumaysan weydeen?
**32** Laakiin haddii aynu nidhaahno, Xagga dadka ayuu ka
yimid, dadkay ka baqeen. Waayo, kulli waxay u haysteen
Yooxanaa inuu nebi yahay. **33** Markaasay Ciise u jawaabeen
oo ku yidhaahdeen, Garan mayno. Ciisena wuxuu ku yidhi,
Aniguna idiin sheegi maayo amarka aan waxan ku sameeyo.

**12**
Markaasuu wuxuu bilaabay inuu masaallo kula hadlo
iyaga. Nin baa wuxuu beertay beer canab ah, oo ood
ku heraaray, dabadeedna god macsareed ka dhex qoday,
oo munaarad ka dhisay, oo niman beerrey ah u kiraystay,
oo dal kale tegey. **2** Goortii xilligii yimid, ayuu addoon u
soo diray beerreydii inuu beerreydii midhihii beerta ka soo
qaado. **3** Markaasay qabteen oo garaaceen oo waxla'aan ku
direen. **4** Haddana addoon kale ayuu u soo diray. Kaasay
dakhreen oo ceebeeyeen. **5** Haddana mid kale ayuu u soo
diray, wayna dileen; oo qaar kale oo badan ayuu diray. Qaar
waa la garaacay; qaarna waa la dilay. **6** Weliba wuxuu
lahaa wiil keliya oo uu jeclaa. Kolkii ugu dambaysay ayuu u
soo diray isagii, oo wuxuu yidhi, Wiilkayga way maamuusi
doonaan. **7** Laakiin beerreydii waxay isku yidhaahdeen,
Kanu waa kii dhaxalka lahaa, kaalaya aan dilnee, dhaxalkiina
innagaa lahaan doonna. **8** Way qabteen, wayna dileen, oo
beertii canabka ahayd dibaddeeda ku tuureen. **9** Haddaba
sayidkii beerta canabka ah muxuu samayn doonaa? Wuu
iman doonaa oo beerreyda dili doonaa, dad kalena ayuu
beerta canabka ah u dhiibi doonaa. **10** Miyaanaydin weligiin
Qorniinka ka akhriyin Dhagixii kuwa wax dhisaa ay diideen,
Kaasu wuxuu noqday madaxa rukunka. **11** Tanu xagga
Rabbiga bay ka timid; Oo waa ku yaab indhahayaga? **12**
Markaasay waxay dooneen inay qabtaan, laakiin dadkay
ka baqeen; waayo, way garteen inuu masaalka iyaga kaga
hadlay, markaasay iska daayeen oo ka tageen. **13** Waxay
u soo direen Farrisiinta iyo Herodosiinta qaarkood si ay
hadalkiisa ugu qabtaan. **14** Goortay yimaadeen waxay ku
yidhaahdeen, Macallimow, waannu og nahay inaad run
tahay oo aanad ninna u eexan, waayo, dadka wejigooda ma
eegtid, jidka Ilaahse aad run ku bartid. Ma xalaal baa in
cashuur Kaysar la siiyo ama inaan la siin? **15** Ma siinna
mise ma siinno? Isaguse labawejiilenimadooda ayuu gartay,
oo wuxuu ku yidhi, Maxaad ii jirrabaysaan? Dinaar ii keena
aan arko e. **16** Wayna u keeneen, oo wuxuu ku yidhi, Yaa
leh masawirkan iyo qorniinkan? Waxay ku yidhaahdeen,
Kaysar baa leh. **17** Ciise baa u jawaabay oo ku yidhi,
Kaysar siiya wixii Kaysar leeyahay, Ilaahna siiya wixii Ilaah

leeyahay. Wayna ka yaabeen. 18 Markaasaa waxaa u
yimid Sadukiin kuwii odhan jiray, Sarakicidda kuwii dhintay
ma jirto. Oo waxay weyddiiyeen oo ku yidhaahdeen, 19
Macallimow, Muuse wuxuu noo qoray, Nin walaalkiis hadduu
dhinto oo naag ka tago isagoo aan ilmo lahayn, walaalkiis
naagtiisa waa inuu dumaalo oo uu carruur walaalkiis u
dhalo. 20 Waxaa jiray toddoba walaalo ah. Kii ugu horreeyey
naag buu qabay, wuuna dhintay, dhalna kama tegin. 21
Kii labaad baa dumaalay, wuuna dhintay, isaguna dhal
kama tegin, oo sidaas oo kalaa ku dhacday kii saddexaad.
22 Toddobadii way wada guursadeen, dhalna kama tegin.
Kulligood dabadood naagtiina waa dhimatay. 23 Wakhtiga
sarakicidda kuwii dhintay iyaga kee bay naagtiisii ahaan
doontaa? Waayo, toddobadu way wada guursadeen. 24
Ciise baa u jawaabay oo ku yidhi, Sidaa darteed miyaydnaan
qaldamin? Waayo, Qorniinka iyo xoogga Ilaah midna garan
maysaan. 25 Waayo, goortay kuwii dhintay ka soo sara
kacaan layskuma guursado, guurna layskuma siiyo, laakiin
waxay yihiin sida malaa'igaha jannada ku jira. 26 Oo xagga
kuwii dhintay in la sara kiciyo miyaydnaan kitaabkii Muuse
ka akhriyin sidii Ilaah geedkii ugala soo hadlay oo yidhi,
Anigu waxaan ahay Ilaaha Ibraahim iyo Ilaaha Isxaaq iyo
Ilaaha Yacquub? 27 Isagu ma aha Ilaaha kuwa dhintay,
laakiin waa Ilaaha kuwa nool. Idinku aad baad u qaldan
tihiin. 28 Kolkaasaa culimmada midkood u yimid, oo markuu
maqlay iyagoo wada hadlaya, oo markuu gartay inuu si
wanaagsan u jawaabay, ayuu wax weyddiiyey oo ku yidhi,
Qaynuunkee baa ka horreeya kuwa kale oo dhan? 29
Markaasaa Ciise u jawaabay oo ku yidhi, Kan ugu horreeyaa
waxaa weeye, Maqal, Israa'iilow, Rabbiga Ilaaheenna ah
waa Rabbi keliya. 30 Waa inaad Rabbiga Ilaahaaga ah
ka jeclaataa qalbigaaga oo dhan, iyo naftaada oo dhan,
iyo caqligaaga oo dhan, iyo xooggaaga oo dhan. 31 Ku
labaad waa kan, Waa inaad deriskaaga u jeclaataa sida
naftaada. Qaynuun kale oo kuwan ka weyn ma jiro. 32
Waxaa culimmada mid ka mid ahu ku yidhi, Sida runta
ah, Macallimow, si wanaagsan baad u hadashay markaad
tidhi, Isagu waa mid keliya, oo mid kalena ma jiro isaga ma
ahaane. 33 In laga jeclaado qalbiga oo dhan, iyo caqliga oo
dhan, iyo nafta oo dhan, iyo xoogga oo dhan, iyo in deriska
loo jeclaado sida nafta, taasaa ka sii wanaagsan allabaryo la
wada gubo iyo allabaryo kale oo dhanba. 34 Markii Ciise
arkay inuu miyir ku jawaabay, wuxuu ku yidhi, Boqortooyada
Ilaah kama aad fogid. Markaas dabadeed ninna kuma dhicin
inuu wax weyddiiyo. 35 Ciise baa u jawaabay oo ku yidhi,
intuu macbudka wax ku barayay, Culimmadu sidee bay
u yidhaahdaan, Masiixu waa ina Daa'uud? 36 Daa'uud
qudhiisuna, isagoo Ruuxa Quduuskaa ku hadlaya, ayuu
wuxuu yidhi, Rabbigu wuxuu Sayidkayga ku yidhi, Midigtayda
fadhiiso, Ilaa aan cadaawayaashaada cagahaaga hoostooda
geliyo. 37 Daa'uud qudhiisa ayaa ugu yeedhay Sayid, sidee
buu wiilkiisa u yahay? Dadkii badnaana farxad bay ku
maqleen. 38 Markuu wax barayay wuxuu ku yidhi, Iska
jira culimmada oo doonaya inay khamiisyo dhaadheer ku
socdaan, oo jecel salaanta suuqa, 39 iyo kursiyada hore oo
sunagogyada, iyo meelaha hore oo diyaafadaha. 40 Waxay
yihiin kuwa wada laasta guryaha carmallada, oo tukashooyin
dhaadheer ayay istusid u tukadaan. Kuwaas waxay heli
doonaan xisaab aad u daran. 41 Ciise wuxuu fadhiistay meel
ka hor jeedda khasnaddii, oo wuxuu eegayay sida dadku
lacagta ugu ridayo khasnaddii. Qaar badan oo hodon ah
ayaa wax badan ku riday. 42 Markaasaa waxaa yimid carmal
miskiin ah. Iyadu waxay ku ridday laba lacag ah oo yaryar oo
qiimadood beesad tahay. 43 Markaasuu xertiisii u yeedhay oo
ku yidhi, Runtii waxaan idinku leeyahay, Carmalkan miskiinta
ah waxay ku ridday wax ka badan wixii ay dhammaan ku
ridayaan khasnaddii. 44 Waayo, kulligood waxay kaga rideen
waxoodii badnaa, iyaduse miskiinnimadeeday kaga ridday
wixii ay lahayd oo dhan, xataa wixii ay ku noolaan lahayd oo
dhan.

13 Goortuu macbudka ka baxay, xertiisa midkood ayaa
ku yidhi, Eeg, Macallimow, dhagaxyada iyo dhismaha
siday u weyn yihiin! 2 Ciise wuxuu ku yidhi, Guryahan
waaweyn ma arkaysaa? Halkan lagu dul dayn maayo dhagax
dhagax kale dushiisa oo aan la dumin doonin. 3 Oo intuu
Buur Saytuun fadhiistay, meel macbudka ku toosan, Butros
iyo Yacquub iyo Yooxanaa iyo Andaros waxay keli ahaan u
weyddiiyeen, oo ku yidhaahdeen, 4 Noo sheeg, Goormay
waxyaalahanu ahaan doonaan? Calaamadu maxay ahaan
doontaa, goortii waxyaalahan oo dhan dhammaan u dhowaan
doonaan? 5 Ciise baa u jawaabay oo bilaabay inuu ku
yidhaahdo, Iska eega yaan laydin khiyaanayn. 6 Qaar badan
ayaa magacayga ku iman doona, oo waxay odhan doonaan,
Anigu waxaan ahay isaga, oo qaar badan ayay khiyaanayn
doonaan. 7 Goortaad dagaallo maqashaan iyo dagaallo
hadalhayntood ha baqanina. Waxaasu waa inay dhacaan,
laakiin dhammaadku weli weeye. 8 Waayo, quruunba quruun
bay ku kici doontaa, boqortooyona boqortooyo, oo waxaa
meelo kala duwan ka dhici doona dhulgariir iyo abaaro.
Waxanu waa bilowga hoogagga. 9 Laakiin iska jira. Waxaa
laydiin dhiibi doonaa shirar, oo sunagogyo waa laydinku
karbaashi doonaa; taliyayaal iyo boqorro hortooda ayaad
daraadday u istaagi doontaan inaad markhaati u ahaataan.
10 Horta injiilka waa in lagu wacdiyo quruumaha oo dhan.

11 Oo goortii laydin wado oo laydin gacangeliyo, horta
ha ka welwelina wixii aad ku hadli doontaan; laakiin wixii
saacaddaas laydin siiyo, waxaas ku hadla, waayo, ma aha
idinka kuwa hadlayaa laakiin waa Ruuxa Quduuska ah.
12 Walaalba walaalkiis wuxuu u dhiibi doonaa in la dilo,
aabbena wiilkiis, carruurna waalidkood ayay ku kici doonaan,
oo dhimasho ay gaadhsiin doonaan. 13 Dadka oo dhan
ayaa magacayga aawadiis idiin necbaan doona, laakiin kan
ilaa ugu dambaysta adkaysta kaasaa badbaadi doona. 14
Laakiin goortaad aragtaan waxa baas oo hallaynta ah oo
taagan meeshii uusan lahayn inuu taagnaado (kii akhriyaa
ha garto), markaas kuwa Yahuudiya joogaa buuraha ha u
carareen. 15 Kii guri fuushanuna yaanu guriga u soo degin
oo gelin inuu wax ka soo qaato. 16 Kii beer joogaana yaanu
dib ugu noqon inuu dharkiisa soo qaato. 17 Laakiin waa u
hoog kuwa uurka leh iyo kuwa wakhtigaas ilmo nuujinaya. 18
Barya inaan waxaasu noqon wakhtiga qabowga. 19 Waayo,
maalmahaas waxay ahaan doonaan dhib sida mid aan
jirin tan iyo bilowgii abuurniinta oo Ilaah abuuray, mana
jiri doonto weligeed. 20 Oo haddaan Rabbigu wakhtigaas
gaabin, ninna ma uu badbaadeen, laakiin kuwuu doortay
aawadood ayuu wakhtigaas u gaabshay. 21 Markaas haddii
nin idinku yidhaahdo, Waa kan Masiixii, ama, Waa kaas,
ha rumaysanina. 22 Waayo, waxaa kici doona Masiixyo
been ah iyo nebiyo been ah, oo waxay samayn doonaan
calaamooyin iyo yaabab si ay xataa kuwa la doortay u
khiyaaneeyaan hadday u suurtowdo. 23 Laakiin idinku iska
jira, wax walbaba horaan idiinku sheegaye. 24 Laakiin
wakhtigaas, dhibtaas dabadeed, qorraxdu waa madoobaan
doontaa, dayaxuna ma nuuri doono, 25 xiddiguhuna cirka
waa ka soo dhici doonaan, xoogagga cirka ku jirana waa
la gariirin doonaa. 26 Markaasay waxay arki doonaan
Wiilka Aadanaha oo daruuraha ku imanaya isagoo leh xoog
badan iyo ammaan. 27 Markaasuu wuxuu soo diri doonaa
malaa'igihiisa, oo kuwuu doortay ayuu ka soo ururin doonaa
afarta jahood ee meesha dhulka ugu fog ilaa meesha cirka
ugu fog. 28 Haddeer geedka berdaha ah masaal ka garta.
Intii laantiisu curdan tahay oo caleemo bixinayso, waxaad
garanaysaan inuu roobku dhow yahay. 29 Idinkuna sidaas
oo kale goortaad aragtaan waxaas oo dhacaya, garta inuu
Wiilka Aadanahu dhow yahay oo albaabbada ag joogo. 30
Runtii waxaan idinku leeyahay, Qarniganu ma idlaan doono
intaanay waxan oo dhammi dhicin. 31 Cirka iyo dhulku waa
idlaan doonaan, laakiinse hadalladaydu ma idlaan doonaan.
32 Laakiin maalintaas iyo saacaddaas ninna waxba kama
oga, malaa'igaha jannada ku jira iyo Wiilka toona, midna ma
oga, Aabbaha keliya maahee. 33 Iska jira oo soo jeeda,
waayo, ma ogidin wakhtigu goortuu yahay. 34 Waa sidii
nin dal kale tegey oo gurigiisii kaga tegey. Addoommadiisa
ayuu amar siiyey, nin walbana shuqulkiisa; wuxuuna amray
albaabjoogahu inuu soo jeedo. 35 Soo jeeda haddaba,
waayo, idinku ma ogidin sayidkii guriga lahaa goortuu
imanayo, inay tahay makhrib, ama habeenbadhkii, ama
goortii diiqu ciyo, ama aroortiiba, 36 waayo, waaba intaasuu
idinku soo kediyaa oo uu idin helaa idinkoo hurda. 37
Waxaan idinku leeyahay ayaan dadkii oo dhan ku leeyahay,
Soo jeeda.

14 Laba maalmood dabadeed waxaa jiray Iiddii Kormaridda
iyo Iiddii Kibistii-aan-khamiirka-lahayn. Wadaaddadii
sare iyo culimmadii waxay doonayeen si ay khiyaano ugu
qabtaan oo ay u dilaan. 2 Waayo, waxay yidhaahdeen,
Yaanay noqon wakhtiga iidda si aan rabshad dadka uga dhex
kicin. 3 Ciise goortuu Beytaniya joogay oo ku jiray guriga
Simoon kii baraska qabi jiray, intuu cuntada u fadhiyey, waxaa
u timid naag haysa weel alabastar ah oo cadar naaradiin oo
qaali ah ku jiro. Weelkii bay jebisay, oo cadarkii madaxiisay
ku shubtay. 4 Waxaa joogay kuwa qalbiga ka cadhooday,
oo waxay isku yidhaahdeen, Cadarkii maxaa sidan loogu
khasaariyey? 5 Waayo, cadarkan waxaa lagu iibin kari lahaa
wax saddex boqol oo dinaar ka badan oo masaakiinta la
siin lahaa, wayna ku gunuunaceen iyadii. 6 Laakiin Ciise
baa ku yidhi, Daaya. Maxaad iyada u dhibaysaan? Shuqul
wanaagsan ayay igu samaysaye. 7 Waayo, masaakiintu
mar walba way idinla jiraan. Markaad doonaysaan wax
wanaagsan waad u samayn kartaan. Aniguse mar walba
idinlama joogo. 8 Way samaysay waxay kartay. Waxay hore
ugu soo baxday inay jidhkayga udgoonayso aasniintayda
aawadeed. 9 Runtii waxaan idinku leeyahay, Dunida oo dhan
meel alla meeshii injiilkan lagu wacdiyo, waxay samaysay
ayaa xusuusteeda lagaga hadli doonaa. 10 Yuudas Iskariyod
oo ahaa mid laba-iyo-tobanka ka mid ah ayaa u tegey
wadaaddada sare inuu u gacangeliyo. 11 Iyagu markay
maqleen ayay farxeen oo waxay ka ballanqaadeen inay
lacag siiyaan. Markaasuu doonayay goor wanaagsan oo uu u
soo gacangeliyo. 12 Maalinta ugu horraysay oo Iiddii Kibistii-
aan-khamiirka-lahayn, goortii neefka Kormaridda la gowraco
ayaa xertiisii ku tidhi, Xaggee baad doonaysaa inaannu
tagno oo ku diyaargarayno inaad cuntid cashada Iidda
Kormaridda? 13 Wuxuu diray laba xertiisii ah oo ku yidhi,
Magaalada gala, oo waxaa idinla kulmi doona nin ashuun
biyah sita; isaga raaca. 14 Meeshuu galo waxaad ninkii
guriga lahaa ku tidhaahdaan, Macallinkii wuxuu leeyahay,
Meeday qolladdaydii martidu oo aan xertayda kula cuni

doono cashada Iidda Kormaridda? 15 Wuxuu idin tusayaa
qollad weyn oo sare oo goglan oo diyaar ah; halkaa inoogu
diyaargareeya. 16 Xertiisii ayaa baxday oo magaalada
gashay, wayna heleen siduu u sheegay, oo cashada Iidda
Kormaridda ayay diyaargareeyeen. 17 Goortii makhribkii
la gaadhay ayuu laba-iyo-tobankii la yimid. 18 Oo intay
fadhiisteen oo wax cunayeen, Ciise baa yidhi, Runtii waxaan
idinku leeyahay, Midkiin oo wax ila cunaya ayaa i gacangelin
doona. 19 Markaasay calool xumaadeen, oo mid baa mid ku
yidhi, Ma aniga baa? 20 Wuu u jawaabay oo wuxuu ku yidhi,
Waa mid ka mid ah laba-iyo-tobankii oo saxanka gacanta
ila gesha. 21 Wiilka Aadanahu waa baxayaa siday u qoran
tahay, laakiin hoog waxaa leh ninkaas Wiilka Aadanaha
gacangelinaya. Waxaa ninkaas u wanaagsanaan lahayd
inaanu dhalan. 22 Oo intay wax cunayeen, Ciise ayaa kibis
qaaday oo barakeeyey, wuuna jejebiyey oo iyaga siiyey oo
yidhi, Qaata, tanu waa jidhkaygiiye. 23 Kolkaasuu koobkii
qaaday oo mahadnaqay oo siiyey iyaga, oo kulli way ka wada
cabbeen. 24 Wuxuu ku yidhi, Kanu waa dhiiggayga axdiga
cusub kan kuwo badan loo daadshay. 25 Runtii waxaan
idinku leeyahay, Mar dambe midhaha geedka canabka ah
kama cabbi doono ilaa maalinta aan boqortooyada Ilaah ka
cabbi doono kan cusub. 26 Goortay gabay ammaan ah ku
gabyeen waxay u baxeen Buur Saytuun. 27 Markaasaa Ciise
wuxuu ku yidhi, Kulligiin waad iga xumaan doontaan, waayo,
waxaa qoran, Adhijirkaan dili doonaa, idahuna waa kala
firdhi doonaan. 28 Laakiin markii kuwii dhintay layga sara
kiciyo dabadeed ayaan Galili hortiin tegi doonaa. 29 Laakiin
Butros ayaa ku yidhi, In kastoo kulligood kaa xumaadaan,
aniguse kaa xumaan maayo. 30 Ciise wuxuu ku yidhi, Runtii
waxaan kugu leeyahay, Maalintan, xataa caawa, intaan
diiqu laba goor ciyin, saddex kol ayaad i dafiri doontaa. 31
Laakiin aad buu ugu celceliyey, Haddaan leeyahay inaan
kula dhinto, kolleyba ku dafiri maayo. Kulligoodba sidaas
oo kale ayay yidhaahdeen. 32 Markaasay yimaadeen meel
Getsemane la odhan jiray, wuxuuna xertiisii ku yidhi, Halkan
fadhiista intii aan soo tukanayo. 33 Oo wuxuu watay Butros
iyo Yacquub iyo Yooxanaa, oo wuxuu bilaabay inuu calool
xumaado oo tiraanyoodo. 34 Markaasuu ku yidhi, Naftaydu
aad bay u calool xun tahay tan iyo dhimasho; halkan
jooga oo soo jeeda. 35 Waxoogaa ayuu hore u socday oo
dhulkuu ku dhacay, wuxuuna tukaday in hadday suurtowdo
saacaddu ay dhaafto. 36 Wuxuuna yidhi, Aabbow, Aabbe,
wax walbaba waad karaysaa. Koobkan iga qaad, laakiin
yaanay noqon waxaan doonayo, ee waxaad doonaysid
ha noqoto. 37 Markaasuu yimid oo wuxuu arkay iyagoo
hurda, oo wuxuu Butros ku yidhi, Simoonow, ma huruddaa?
Miyaad kari wayday inaad saacad keliya soo jeeddo? 38
Soo jeeda oo tukada inaydnaan jirrabaadda gelin. Ruuxu
waa diyaar, laakiin jidhku waa itaal daranyahay. 39 Mar
kale ayuu tegey oo tukaday isagoo hadalkii oo kale ku
hadlaya. 40 Mar kale ayuu yimid oo arkay iyagoo hurda,
waayo, indhahoodu lulmay la cuslaayeen, ma ayna garan
waxay ugu jawaabaan. 41 Kolkii saddexaad ayuu yimid
oo ku yidhi, Hadda seexda oo nasta, waa ku filan tahay.
Saacaddii waa timid. Bal eega, Wiilka Aadanaha ayaa
dembilayaal loo gacangelinayaa. 42 Kaca aan tagnee. Eega,
kii i gacangelin lahaa waa soo dhow yahay. 43 Kolkiiba
intuu weli hadlayay ayaa Yuudas oo laba-iyo-tobankii ka mid
ahaa yimid, isaga iyo dad aad u badan oo seefo iyo ulo
sita. Waxay ka yimaadeen wadaaddada sare iyo culimmada
iyo waayeellada. 44 Kii gacangeliyey ayaa calaamo kula
ballamay oo ku yidhi, Mid alla midkaan dhunkado waa isagii.
Qabta oo kaxeeya oo dhawra. 45 Kolkuu yimidba, kolkiiba
ayuu u tegey oo ku yidhi, Macallimow, wuuna dhunkaday. 46
Markaasay gacmaha saareen, wayna qabteen. 47 Midkooda
oo ag taagnaa ayaa seeftiisa soo bixiyey, oo wuxuu ku
dhuftay wadaadkii sare addoonkiisii, oo dheg buu ka gooyay.
48 Ciise baa u jawaabay oo ku yidhi, Ma waxaad iila soo
baxdeen seefo iyo ulo inaad i qabataan sidaan tuug ahay?
49 Maalin walbaba macbudka ayaan idinkula jiri jiray oo wax
bari jiray, imana aydnaan qabsan, laakiin Qorniinku waa inuu
rumoobo. 50 Markaasay xertii ka wada tageen oo cararen.
51 Waxaa daba socday nin dhallinyaro ah oo qaawanaantiisa
maro jilicsan ka huwaday; wayna qabteen. 52 Laakiin maradii
jilicsanayd ayuu ka tegey oo ka cararay isagoo qaawan. 53
Ciisena waxay u geeyeen wadaadkii sare, waxaana u soo
ururay wadaaddadii sare iyo waayeelladii iyo culimmadii. 54
Butros baa meel fog ka soo daba socday, oo wuxuu galay
barxadda wadaadkii sare oo la fadhiistay askartii, dabkana
ayuu kulaalay. 55 Wadaaddadii sare iyo shirkii oo dhan
ayaa waxay dooneen markhaati Ciise ka gees ah si ay u
dilaan, waase heli waayeen. 56 Waayo, qaar badan baa
marag been ah ku fureen, laakiin maraggoodii isku mid ma
ahayn. 57 Markaasaa waxaa kacay qaar marag been ah ku
furay oo yidhaahdeen, 58 Waxaannu maqalnay isagoo leh,
Macbudkan gacmo lagu sameeyey ayaan dudumin doonaa,
saddex maalmood dabadeed waxaan dhisi doonaa mid
kale oo aan gacmo lagu samayn. 59 Laakiin sidaasuuna
maraggoodii isku mid u ahayn. 60 Markaasaa wadaadkii sare
dhexda istaagay oo Ciise weyddiiyey isagoo leh, Miyaanad
waxba ka jawaabayn? Kuwanu waxay kugu marag furayaan
waa maxay? 61 Isaguse waa iska aamusay oo waxba uma
jawaabin. Mar kale wadaadkii sare ayaa weyddiiyey oo ku

yidhi, Miyaad tahay Masiixa oo ah Wiilka Kan la ammaano?
62 Ciise baa yidhi, Waan ahay, oo waxaad arki doontaan
Wiilka Aadanaha oo fadhiya midigta xoogga Ilaah, oo ku
imanaya daruuraha cirka. 63 Markaasaa wadaadkii sare
dharkiisii jeexjeexay oo yidhi, Maxaannu markhaatiyaal weli
ugu baahan nahay? 64 Waad maqasheen caytanka. Maxay
idinla tahay? Kulligood waxay xukumeen inuu dhimasho
istaahilo. 65 Qaar waxay bilaabeen inay candhuuf ku
tufaan oo wejigiisa daboolaan oo garaacaan, waxayna ku
yidhaahdeen, Wax sheeg. Askartiina way dharbaaxeen. 66
Butros intuu hoosta joogay xaggii barxadda, waxaa u timid
mid ka mid ah hablihii wadaadkii sare u shaqaynayay, 67 oo
markay aragtay Butros oo dabka kulaalaya, ayay dayday oo
tidhi, Adiguna waxaad la jirtay Ciisihii reer Naasared. 68
Laakiin wuu dafiray oo wuxuu ku yidhi, Anigu ma aqaan,
garanba maayo waxaad leedahay. Markaasuu albaabka
agtiisa tegey, diiqiina waa ciyey. 69 Gabadhii baa aragtay oo
bilowday haddana inay kuwii ag taagnaa ku tidhaahdo, Kanu
waa midkood. 70 Laakiin mar kale ayuu dafiray. Waxoogaa
yar dabadeed kuwii ag taagnaa ayaa mar kale Butros ku
yidhi, Run weeye, adiguna midkood baad tahay, waayo,
waxaad tahay reer Galili, afkaaguna waa la mid afkooda. 71
Laakiin wuxuu bilaabay inuu habaaro oo dhaarto isagoo leh,
Anigu garan maayo ninkaas aad ka hadlaysaan. 72 Kolkii
labaad ayaa diiqii ciyey; oo Butros wuxuu xusuustay hadalkii
Ciise ku hadlay, Diiqu intaanu laba goor ciyin, saddex kol
ayaad i dafiri doontaa, oo intuu ka fikirayay ayuu ooyay.

**15** Aroortii kolkiiba wadaaddadii sare waxay la wada
hadleen waayeelladii iyo culimmadii iyo shirkii oo
dhan. Ciisena way xidheen oo kaxeeyeen oo waxay u
dhiibeen Bilaatos. 2 Bilaatos wuxuu weyddiiyey, Ma Boqorka
Yuhuudda baad tahay? Wuu u jawaabay oo ku yidhi,
Waad tidhi. 3 Markaasaa wadaaddadii sare wax badan ku
ashtakeeyeen. 4 Bilaatos baa kol dambe wax weyddiiyey
isagoo leh, Miyaanad waxba ka jawaabayn? Bal eeg intii ay
kugu ashtakaynayaan. 5 Laakiin Ciise weli waxba ugama
jawaabin, sidaa darteed Bilaatos waa la yaabay. 6 Iiddaas
wuxuu iyaga u sii dayn jiray maxbuuskay doonayeen. 7
Markaasaa waxaa jiray nin Baraabbas la odhan jiray oo
ahaa mid lala xidhay kuwii kula kacay oo wax dilay markii
fidmaddu dhacday. 8 Dadkii badnaa ayaa Bilaatos u kacay
oo bilaabay inay doonaan inuu u sameeyo siduu u samayn
jiray. 9 Bilaatos baa u jawaabay oo ku yidhi, Ma waxaad
doonaysaan inaan idiin sii daayo Boqorka Yuhuudda? 10
Waayo, wuxuu ogaa wadaaddadii sare inay hinaaso ugu
soo dhiibeen. 11 Laakiin wadaaddadii sare ayaa dadka
kiciyey, oo waxay yidhaahdeen inay u roon tahay inuu
Baraabbas u sii daayo iyaga. 12 Bilaatos baa mar kale u
jawaabay oo ku yidhi, Haddaba maxaad doonaysaan inaan
ku sameeyo kan aad ugu yeedhaan Boqorka Yuhuudda?
13 Iyaguna mar kale ayay ku qayliyeen, Iskutallaabta ku
qodob. 14 Markaasaa Bilaatos ku yidhi, Waa maxay sharkuu
falay? Laakiin aad bay u sii qayliyeen oo yidhaahdeen,
Iskutallaabta ku qodob. 15 Bilaatos wuxuu doonayay inuu
sameeyo waxa dadku raalli ka yahay, sidaa darteed ayuu
Baraabbas u sii daayay, oo goortuu Ciise karbaashay
ayuu u dhiibay in iskutallaabta lagu qodbo. 16 Markaasaa
askartii isaga geeyeen barxaddii dhexdeeda, taasoo la
odhan jiray Baraytoriyon, waxayna isugu yeedheen askartii
oo dhan. 17 Waxay u geliyeen dhar guduudan, oo taaj ayay
qodxan uga texeen, oo madaxiisay saareen. 18 Markaasay
salaameen oo waxay ku yidhaahdeen, Nabad, Boqorka
Yuhuuddow. 19 Madaxana ayay cawsduur kaga dhufteen,
oo wayna ku candhuufeen, oo u jilba joogsadeen, oo u
sujuudeen. 20 Goortay ku majaajiloodeen dabadeed ayay
dharkii guduudnaa ka qaadeen oo dharkiisii bay u geliyeen,
markaasay wadeen in iskutallaabta lagu qodbo. 21 Waxaa
ag marayay nin beeraha ka yimid, oo reer Kuranaya ah, oo
Simoon la odhan jiray, oo ahaa aabbihii Aleksanderos iyo
Rufus, kan ay ku qasbeen inuu iskutallaabtiisa u qaado. 22
Oo waxay u soo wadeen meel Golgota la odhan jiray, taasoo
micneheedu yahay meeshii dhakada. 23 Waxay siiyeen
inuu cabbo khamri xammeeti lagu daray, laakiin ma uu
qaadan. 24 Oo goortay iskutallaabta ku qodbeen, dharkiisay
qaybsadeen, wayna saami ku riteen mid kasta wuxuu
qaadan lahaa. 25 Waxayna ahayd saacaddii saddexaad oo
iskutallaabta ay ku qodbeen. 26 Waxaa lagu qoray meel ka
korraysa isaga qorniinkii ashtakadiisii oo leh, BOQORKA
YUHUUDDA. 27 Markaasaa waxaa iskutallaabo lagula
qodbay laba tuug, mid midigtiisa, midna bidixdiisa. 28 Oo
waxaa rumoobay Qorniinkii yidhi, Waxaa isaga lagu tiriyey
sharcilaawayaasha. 29 Oo kuwii ag marayayna waa caayeen,
oo intay madaxooda luleen, waxay yidhaahdeen, Kaaga
macbudka duminayow oo saddex maalmood ku dhisayow, 30
isbadbaadi oo iskutallaabta ka soo deg. 31 Sidaas oo kalena
ayaa wadaaddada sare dhexdooda ugu majaajiloodeen,
iyaga iyo culimmadaba, oo waxay yidhaahdeen, Kuwa kale
ayuu badbaadiyey, qudhiisa isma badbaadin karo. 32 Masiixa
oo ah Boqorka Israa'iil haddeer iskutallaabta ha ka soo dego
si aannu u aragno oo u rumaysanno. Kuwii iskutallaabaha
lagula qodbayna ayaa caayay. 33 Goortii saacaddii lixaad
la gaadhay, dhulka oo dhammu gudcur buu ahaa ilaa
saacaddii sagaalaad. 34 Saacaddii sagaalaad Ciise ayaa cod

weyn ku dhawaaqay oo yidhi, Eloy, Eloy, lama sabakhtani?
taasoo micneheedu yahay, Ilaahayow, Ilaahayow, maxaad
ii dayrisay? **35** Kuwa ag taagnaa qaarkood ayaa goortay
maqleen yidhi, Eeg, wuxuu u yeedhayaa Eliyaas. **36** Mid baa
orday, oo geed isbonji la yidhaahdo khal uga soo buuxshay,
oo intuu cawsduur saaray ayuu siiyey inuu cabbo, wuxuuna
yidhi, Daaya aannu aragnee inuu Eliyaas yimaado oo soo
dejiyo. **37** Markaasaa Ciise cod weyn ku dhawaaqay oo
ruuxii bixiyey. **38** Markaasaa daahii macbudka kor ilaa hoos
laba u kala dillaacay. **39** Kolkaasaa boqol-u-taliyihii oo meel
ku toosan taagnaa markuu arkay inuu sidaas ruuxiisii u
baxshay, wuxuu yidhi, Runtii, ninkanu wuxuu ahaa Wiilkii
Ilaah. **40** Waxaana joogay dumar meel fog ka eegayay, oo
waxaa ku dhex jirtay Maryan tii reer Magdala, iyo Maryan oo
ahayd Yacquub Yare iyo Yoosee hooyadood, iyo Saloome,
**41** oo ah kuwa xataa intuu Galili joogay raaci jiray oo u adeegi
jiray, iyo qaar kale oo badan oo Yeruusaalem u sii raacay.
**42** Haddaba waxay ahayd Maalintii Diyaargarayska, taas
oo ah maalinta sabtida ka horraysa, oo markii makhribkii
la gaadhay, **43** waxaa yimid Yuusuf kii reer Arimataya oo
ahaa taliye murwad leh, oo isna boqortooyadii Ilaah ayuu
sugayay. Isagu wuxuu dhiranaan ugu galay Bilaatos oo ka
baryay Ciise meydkiisii. **44** Bilaatos waa yaabay inuu hadda
dhintay. Markaasuu wuxuu u yeedhay boqol-u-taliyihii oo
weyddiiyey, Durba miyuu dhintay? **45** Goortuu ka gartay
boqol-u-taliyihii, ayuu meydkii Yuusuf siiyey. **46** Markaasaa
Yuusuf wuxuu soo iibsaday kafan, wuuna soo dejiyey isaga,
oo kafantii ku duudduubay, oo wuxuu geliyey xabaal dhagax
ka qodnayd, oo xabaashii afkeedii wuxuu ku soo giringiriyey
dhagax weyn. **47** Maryan tii reer Magdala iyo Maryan oo
ahayd hooyadii Yoosee waxay arkeen meeshii la dhigay.

**16** Goortii sabtidii dhammaatay Maryan tii reer Magdala,
iyo Maryan oo ahayd Yacquub hooyadiis, iyo Saloome,
waxay iibsadeen dhir udgoon inay u yimaadaan oo mariyaan
isaga. **2** Waaberigii maalintii ugu horraysay ee toddobaadka
waxay yimaadeen xabaasha goortii qorraxdu soo baxday. **3**
Waxay isku yidhaahdeen, Ayaa dhagaxa xabaashii afkeeda
inooga giringirinaya? **4** Goortay eegeen waxay arkeen
dhagixii oo la giringiriyey; oo aad buu u weynaa. **5** Goortay
xabaashii galeen waxay arkeen nin dhallinyar oo midigta
fadhiya oo khamiis cad gashan, markaasay aad u nexeen. **6**
Wuxuu ku yidhi, Ha nexina. Waxaad doonaysaan Ciisihii reer
Naasared, kan iskutallaabta lagu qodbay. Wuu sara kacay, oo
halkan ma joogo. Waa taa meeshii la dhigay. **7** Laakiin taga,
oo waxaad ku tidhaahdaan xertiisii iyo Butros, Wuu idin hor
marayaa ilaa Galili. Halkaasna waad ku arki doontaan, siduu
idinku yidhi. **8** Markaasay dhaqso u soo baxeen oo xabaasha
ka soo carareen, waayo, way gariireen oo yaabeen. Ninnana
waxba kuma ay odhan, maxaa yeelay, way baqeen. **9 (note:
The most reliable and earliest manuscripts do not include Mark 16:9-20.)**
Waaberigii maalintii ugu horraysay ee toddobaadka ayaa
Ciise sara kacay, oo markii hore wuxuu u muuqday Maryan
tii reer Magdala, tii uu toddoba jinni ka saaray. **10** Iyadu
waa tagtay oo waxay u sheegtay kuwii la joogi jiray, iyagoo
barooranaya oo ooyaya. **11** Iyaguna goortay maqleen inuu
nool yahay oo ay aragtay, way rumaysan waayeen. **12**
Waxan dabadeed isagoo suurad kale ah ayuu u muuqday
laba iyaga ah iyagoo sii socda oo beeraha tegaya. **13**
Markaasay baxeen oo kuwii kale u sheegeen, kuwaasina
ma ay rumaysan. **14** Dabadeed wuxuu u muuqday koob-
iyo-tobankii goortay cunto u fadhiyeen. Wuuna u canaantay
rumaysaddarradooda iyo qalbi engegnaantooda, waayo,
ma ayna rumaysan kuwii isaga arkay goortuu sara kacay
dabadeed. **15** Markaasuu wuxuu iyaga ku yidhi, Dunida oo
dhan taga, oo uunka oo dhan injiilka ku wacdiya. **16** Kii
rumaysta oo la baabtiiso waa badbaadi doonaa, laakiin kii aan
rumaysanin waa la xukumi doonaa. **17** Calaamooyinkanna
ayaa la socon doona kuwa rumaysta. Magacayga ayay
jinniyo ku saari doonaan, afaf cuscusubna ayay ku hadli
doonaan, **18** abeesooyin ayay qaadi doonaan, oo hadday
cabbaan wax lagu dhimanayo waxba ma yeeli doono, gacmo
ayay kuwii buka dul saari doonaan, wayna bogsan doonaan.
**19** Haddaba Rabbi Ciise goortuu la hadlay dabadeed ayaa
samada loo qaaday, wuxuuna fadhiistay Ilaah midigtiisa. **20**
Iyaguna way baxeen oo meel kasta oo ay tageen dadkii bay
wacdiyeen, Rabbiguna waa la shaqaynayay iyaga, isagoo
hadalka ku xaqiijinaya calaamooyinkii la socday. Aamiin.

# Luukos

1 Dad badan waxay ku dadaaleen inay soo hagaajiyaan
sheeko ku saabsan wixii dhexdayada lagu sameeyey oo
la hubsaday, 2 siday noo ogeysiiyeen kuwii tan iyo bilowgii
arkay oo Ereygii u shaqeeyey. 3 Sidaa darteed anigana
waxaa ila wanaagsanayd inaan, anigoo tan iyo bilowgii wax
walba oo dhacay aad u gartay, si hagaagsan kuugu qoro,
Te'ofilosow sharaf weyn lahow, 4 inaad garatid hubniintii
hadalkii lagu baray. 5 Wakhtigii Herodos ahaa boqorkii
Yahuudiya, waxaa jiray wadaad la odhan jiray Sakariyas,
oo ka mid ahaa safkii Abiya; haweenaydiisuna waxay ka
mid ahayd hablihii reer Haaruun, magaceedana waxaa la
odhan jiray Elisabed. 6 Labadooduba xaq bay ku ahaayeen
Ilaah hortiisa, oo qaynuunnadii iyo xukummadii Rabbiga
ayay eedla'aan ku socon jireen. 7 Ilmo ma ay lahayn,
waayo, Elisabed madhalays bay ahayd, oo labadooduba
way da'weynaayeen. 8 Waxaa dhacay, intuu shuqulkii
wadaadnimadii safkiisa dartiis samaynayay Ilaah hortiisa,
9 sida caadadii wadaadnimadu u ahayd, in shuqulkiisu
ahaa inuu foox shido goortuu macbudka Rabbiga galay. 10
Saacaddii fooxa ayaa dadkii badnaa oo dhammu dibadda ku
tukanayeen. 11 Markaasaa waxaa isaga u soo muuqatay
malaa'igtii Rabbiga oo taagnayd meeshii fooxa lagu shido
midigteeda. 12 Goortuu Sakariyas arkay ayuu naxay, wuuna
cabsaday. 13 Laakiin malaa'igtii baa ku tidhi, Ha baqin,
Sakariyasow, waayo, baryadaadii waa la maqlay; afadaada
Elisabedna wiil bay kuu dhali doontaa, magiciisana waxaad
u bixin doontaa Yooxanaa. 14 Waxaad heli doontaa farxad
iyo rayrayn; dad badanna dhalashadiisa ayay ku farxi
doonaan, 15 waayo, Rabbiga hortiisa nin weyn buu ku
ahaan doonaa, mana cabbi doono khamri ama wax lagu
sakhraamo. Waxaana xataa uurka hooyadiis kaga buuxsami
doona Ruuxa Quduuskaa. 16 Reer binu Israa'iil badidoodana
ayuu Rabbiga Ilaahooda ah ku soo jeedin doonaa. 17
Isaguna wuxuu ku hor mari doonaa ruuxii iyo xooggii Eliyaas
inuu aabbayaasha qalbiyadooda ku soo jeediyo carruurta,
iyo inuu caasiyiinta ku soo celiyo xigmadda kuwa xaqa ah,
inuu Rabbiga u diyaargareeyo dad hagaagsan. 18 Sakariyas
wuxuu malaa'igtii ku yidhi, Sidee baan waxan u garan
doonaa? Waayo, anigu oday baan ahay, afadayduna waa
da'weynaatay. 19 Malaa'igtii baa u jawaabtay oo ku tidhi,
Anigu waxaan ahay Jibriil oo Ilaah hortiisa istaaga. Waxaa la
ii soo diray inaan kula hadlo oo aan warkan wanaagsan
kuu keeno. 20 Bal eeg, waad aamusnaan doontaa, mana
hadli kari doonto, ilaa maalinta waxyaalahan dhici doonaan,
waayo, waad rumaysan weyday hadalladayda wakhtigooda
la oofin doono. 21 Dadkuna waxay sugayeen Sakariyas,
oo waxay la yaabeen siduu macbudka ugu raagay. 22
Markuu soo baxay ayuu la hadli kari waayay, markaasay
garteen inuu macbudka wax ku arkay. Kolkaasuu gacanta
ugu sii tilmaamayay iyaga, isagoo sii carrab la'. 23 Kolkii
maalmihii shuqulkiisii wadaadnimadu dhammaadeen ayuu
wuxuu tegey gurigiisii. 24 Maalmahaas dabadeed afadiisa
Elisabed ayaa uuraysatay, oo shan bilood ayay isqarisay
iyadoo leh. 25 Sidaasaa Rabbigu iigu sameeyey maalmihii
uu i eegay inuu ceebtayda dadka dhexdooda iiga qaado. 26
Bishii lixaad Ilaah baa malaa'ig Jibriil u soo diray magaalada
Galili oo Naasared la odhan jiray 27 ilaa gabadh bikrad
ah oo u doonanayd nin la odhan jiray Yuusuf oo dhashii
Daa'uud ahaa; gabadhana waxaa la odhan jiray Maryan.
28 Malaa'igtii baa u soo gashay, oo waxay ku tidhi, Nabad,
adigoo nimcaysan, Rabbiga ayaa kula jira. 29 Markaasay
hadalkii ka naxday, oo waxay isku tidhi, Maxay tahay
salaantan? 30 Malaa'igtii baa ku tidhi, Ha baqin, Maryamay,
waayo, nimco ayaad Ilaah ka heshay. 31 Bal eeg, waad
uuraysan doontaa, oo wiil baad umuli doontaa, magiciisana
waxaad u bixin doontaa Ciise. 32 Nin weyn buu ahaan
doonaa, waxaana loogu yeedhi doonaa Wiilka Kan ugu
sarreeya, Rabbiga Ilaaha ahuna wuxuu siin doonaa carshigii
awowgiis Daa'uud. 33 Weligiiba wuxuu boqor u ahaan
doonaa dadkii Yacquub, boqornimadiisuna ma idlaan doonto.
(aiōn g165) 34 Kolkaasaa Maryan waxay malaa'igtii ku tidhi,
Sidee baa waxanu ku noqon doonaan? Anigu ninna garan
maayo. 35 Malaa'igtii waa u jawaabtay oo ku tidhi, Ruuxa
Quduuska ah ayaa kugu soo degi doona, oo xooggii Kan
ugu sarreeya ayaa hoosiis kuu noqon doona, sidaa darteed
kan quduuska ah oo kaa dhalan doona waxaa loogu yeedhi
doonaa Wiilka Ilaah. 36 Bal eeg, ina-adeertaa Elisabedna
wiil bay uuraysatay iyadoo da'weyn; oo tanuna waxay tii
madhalays loogu yeedhi jiray u tahay bisheedii lixaad. 37
Waayo, wax aan Ilaah kari doonin ma jiro. 38 Maryan ayaa
tidhi, Waa i kan, waxaan ahay addoontii Rabbiga. Sidaad u
hadashay ha ii noqoto. Markaasaa malaa'igtii ka tagtay. 39
Maalmahaas Maryan baa kacday, oo waxay dhaqso u tagtay
dhulkii buuraha lahaa ilaa magaalo ka mid ah reer Yahuudah,
40 oo waxay gashay gurigii Sakariyas, oo salaantay Elisabed.
41 Oo waxaa dhacay goortii Elisabed salaantii Maryan
maqashay in ilmihii uurkeeda ku boodbooday; Elisabedna
waxaa ka buuxsamay Ruuxa Quduuska ah. 42 Markaasay
cod dheer ku qaylisay oo tidhi, Dumarka dhexdooda
waad ku barakaysan tahay, oo midhaha uurkaaga waa
barakaysan yahay. 43 Xaggee waxanu iiga yimaadeen in
Sayidkayga hooyadiis iigu timaado? 44 Bal eeg, markii

codkii salaantaadu dhegahayga ku dhacay, ilmaha uurkayga
ku jira ayaa farxad la boodbooday. **45** Waxaa barakaysan
tii rumaysatay; waayo, waxyaalihii xagga Rabbiga looga
sheegay ayay dhici doonaan. **46** Maryanna waxay tidhi,
Naftaydu Rabbigay weynaynaysaa, **47** Ruuxayguna wuxuu
ku reyreeyey Ilaaha Badbaadiyahayga ah. **48** Waayo, wuxuu
eegay hoosaysnimada addoontiisa, Bal eeg, tan iyo hadhow
qarniyada oo dhammu waxay iigu yeedhi doonaan tan
barakaysan. **49** Waayo, kan xoogga leh ayaa waxyaalo
waaweyn ii sameeyey; Magiciisuna waa Quduus, **50** Tan
iyo ab ka ab naxariistiisu waxay gaadhaa Kuwa isaga ka
cabsada. **51** Wuxuu xoog ku sameeyey gacantiisa, Oo kuwii
fikirradii qalbigoodii ku kibray ayuu kala firdhiyey. **52** Kuwii
xoogga lahaa ayuu carshiyadoodii ka soo dejiyey Oo kuwii
hooseeyey ayuu sarraysiiyey. **53** Kuwii gaajaysnaa ayuu wax
wanaagsan ka dhergiyey, Kuwii hodanka ahaana iyagoo
madhan ayuu diray. **54** Midiidinkiisii Israa'iil ayuu caawiyey
Inuu xusuusto inuu u naxariisto **55** Ibraahim iyo farcankiisii
weligoodba (Siduu awowayaasheennii ula hadlay). **(aiōn
g165)** **56** Maryan waxay iyada la joogtay abbaaraha saddex
bilood, markaasay gurigeeda ku noqotay. **57** Hadda Elisabed
wakhtigii ay umuli lahayd ayaa la joogay, oo wiil bay
dhashay. **58** Derisyadeedii iyo xigaalkeedii ayay maqleen
siduu Rabbigu naxariistiisii ugu weyneeyey iyada, wayna
la farxeen. **59** Waxaa dhacay inay maalintii siddeedaad u
yimaadeen inay wiilkii gudaan, oo waxayna u bixiyeen magicii
aabbihiis Sakariyas. **60** Kolkaasaa hooyadiis u jawaabtay
oo ku tidhi, Sidaas ma aha; waxaase loogu yeedhi doonaa
Yooxanaa. **61** Waxay ku yidhaahdeen, Xigaalkaaga kuma
jiro qof magacaas loo bixiyey. **62** Waxay aabbihiis gacan
ugu tilmaameen oo weyddiiyeen wuxuu doonayay in loogu
yeedho. **63** Markaasuu wuxuu weyddiistay loox oo ku qoray,
isagoo leh, Magiciisu waa Yooxanaa. Wayna wada yaabeen.
**64** Kolkiiba afkiisii ayaa furmay, oo carrabkiisiina waa debcay,
markaasuu hadlay oo Ilaah ammaanay. **65** Dadkii agtooda
joogay oo dhammu way wada cabsadeen, oo hadalladan
oo dhan waa lagaga hadlayay dalkii buuraha lahaa oo
Yahuudiya oo dhan. **66** Kuwa waxyaalahaas maqlay oo dhan
ayaa qalbigooda geliyey oo waxay yidhaahdeen, Haddaba
ilmahanu muxuu noqon doonaa? Waayo, gacantii Rabbiga
ayaa la jirtay isaga. **67** Markaasaa aabbihiis Sakariyas
waxaa ka buuxsamay Ruuxa Quduuska ah, waxna wuu
sii sheegay isagoo leh, **68** Ha ammaanmo Rabbiga ah
Ilaaha Israa'iil, Waayo, dadkiisii ayuu soo booqday oo
furtay. **69** Badbaadiye xoog leh ayuu inoogu kiciyey Gurigii
midiidinkiisa Daa'uud, **70** (Siduu afkii nebiyadiisii quduuska
ahaa tan iyo bilowgii uga hadli jiray), **(aiōn g165)** **71** Inuu inaga
badbaadiyo cadaawayaasheenna iyo gacanta kuwa ina
neceb oo dhan, **72** Iyo inuu u naxariisto awowayaasheen,
Iyo inuu axdigiisii quduuska ahaa xusuusto, **73** Oo ahaa
dhaartii uu awoweheennii Ibraahim ugu dhaartay, **74** Inuu ina
siiyo innagoo cadaawayaasheenna gacmahooda laynaga
bixiyey Inaynu baqdinla'aan isaga ugu hawshoonno **75**
Quduusnimada iyo xaqnimada isaga hortiisa cimrigeenna oo
dhan. **76** Adiguna, ilma yahow, waxaa laguugu yeedhi doonaa
nebigii Kan ugu sarreeya, Waayo, waxaad hor mari doontaa
Rabbiga hortiisa inaad jidadkiisa diyaargaraysid; **77** Oo aad
dadkiisa ogeysiisid badbaadada Ee dembidhaafkooda ah,
**78** Ee laga hela naxariista weyn ee Ilaaheenna, Tan qorraxda
soo baxda xagga sare inaga soo booqan doonta, **79** Inay
iftiimiso kuwa fadhiya gudcurka iyo hooskii dhimashada, Iyo
inay cagaheenna jidkii nabadda ku kaxayso, **80** Wiilkuna
waa koray oo ruuxuu ka xoogoobay, wuxuuna joogay cidlada
ilaa maalintii uu Israa'iil istusi lahaa.

**2** Wakhtigaas waxaa dhacay in amar ka soo baxay Kaysar
Awgustus in dadka dunida jooga oo dhan la qoro. **2**
Qorniinkaas kolkii ugu horreeyey waxaa la sameeyey markii
Kuranayos xukumi jiray Suuriya. **3** Dhammaan waxay u wada
tageen in la qoro, mid kastaba magaaladiisii. **4** Yuusufna
Galili ayuu ka kacay, oo magaaladii Naasared ka tegey,
oo wuxuu aaday Yahuudiya ilaa magaaladii Daa'uud oo
Beytlaxam la odhan jiray, maxaa yeelay, wuxuu ahaa dadkii
iyo dhashii Daa'uud, **5** in lala qoro Maryan oo ahayd tii u
doonanayd oo uurka lahayd. **6** Waxaa dhacay kolkay halkaas
joogeen in maalmihii ay umuli lahayd dhammaadeen, **7**
waxayna umushay wiilkeedii curadka ahaa, markaasay maro
ku duudduubtay oo qabaal ku jiifisay, waayo, meel ay ku
hoydaan ayay hudheelkii ka waayeen. **8** Dalkaas waxaa jiray
adhijirro bannaanka jooga oo habeenkii idahooda ilaalinaya.
**9** Malaa'igtii Rabbiga ayaa ag istaagtay, oo ammaanta
Rabbiga ayaa iftiimisay hareerahooda, aad bayna u baqeen.
**10** Markaasaa malaa'igtii ku tidhi, Ha baqina, waayo, ogaada,
waxaan idiin keenay war wanaagsan oo leh farxad weyn oo u
ahaan dadka oo dhan. **11** Waayo, maanta waxaa magaalada
Daa'uud idiinku dhashay Badbaadiye oo ah Masiixa Rabbiga
ah. **12** Oo waxaa calaamo idiin ahaan tan, waxaad heli
doontaan ilmo maro ku duudduuban oo ku jiifa qabaal. **13**
Dhaqsoba waxaa malaa'igtii la jirtay guuto fara badan oo
jannada ka timid, wayna ammaanayeen Ilaah oo lahaayeen,
**14** Ilaah ha ku ammaanmo meelaha ugu sarreeya, Xagga
dhulkana nabad ha ahaato dadka ka farxiya Ilaah dhexdooda.
**15** Waxaa dhacay markii malaa'igihii ka tageen oo jannada
ku noqdeen in adhijirradii isku yidhaahdeen, Haddana aan

tagno xataa ilaa Beytlaxam, aan aragnee waxaas dhacay oo
Rabbiga ina ogeysiiyey. 16 Markaasay dhaqso u yimaadeen
oo waxay heleen Maryan iyo Yuusufba iyo ilmihii oo qabaal
ku jiifa. 17 Oo goortay arkeen, waxay ogeysiiyeen hadalka
ilmahan looga sheegay iyaga. 18 Dadkii maqlay oo dhanna
ayaa ka yaabay waxyaalihii adhijirradu u sheegeen. 19
Maryanse hadalkaas oo dhan ayay haysatay oo qalbigeeda
kaga fikirtay. 20 Adhijirraduna way noqdeen iyagoo Ilaah ku
ammaanaya oo ku weynaynaya waxyaalihii ay maqleen oo
ay arkeen oo dhan, sidii iyaga loogu sheegay. 21 Goortii
siddeed maalmood dhammaatay oo wiilkii la gudi lahaa,
magiciisii waxaa loo baxshay Ciise, sida malaa'igtii ugu
bixisay intaan uurka lagu uuraysan. 22 Kolkii maalmihii
nadiifiskeeda u dhammaadeen sidii sharciga Muuse lahaa,
waxay geeyeen Yeruusaalem inay Rabbiga u dhiibaan 23
(siday ugu qoran tahay sharciga Rabbiga, Curad walba oo
lab ah waxaa loogu yeedhi doonaa quduus xagga Rabbiga),
24 iyo inay allabari u bixiyaan siday ugu qoran tahay sharciga
Rabbiga, Laba qoolley ama laba xamaam oo yaryar. 25
Bal eeg, waxaa Yeruusaalem joogay nin magiciisii ahaa
Simecoon. Ninkaasu wuxuu ahaa nin xaq ah oo cibaado leh;
wuxuuna sugayay gargaaridda Israa'iil. Ruuxii Quduuska
ahaana waa dul joogay. 26 Waxaana Ruuxii Quduuska
ahaa u muujiyey inaanu dhimasho arag intaanu Rabbiga
Masiixiisa arkin. 27 Oo wuxuu Ruuxii ku galay macbudka,
oo goortii waalidkii keeneen wiilkii Ciise ahaa inay caadadii
sharciga ku sameeyaan, 28 markaasuu gacmihiisa ku
qaaday, oo Ilaah ammaanay, oo yidhi, 29 Rabbiyow, imminka
addoonkaagu nabad ha ku tago, Sida hadalkaagu ahaa,
30 Waayo, indhahaygu waxay arkeen badbaadintaada, 31
Tan aad dadka oo dhan hortiis hagaajisay, 32 Oo ah iftiin
quruumaha lagu muujiyo, Iyo ammaanta dadkaaga Israa'iil.
33 Markaasaa aabbihiis iyo hooyadiis ka yaabeen waxyaalihii
lagaga hadlay isaga. 34 Simecoon ayaa iyaga u duceeyey,
wuxuuna hooyadiis Maryan ku yidhi, Ogow, wiilkan waxaa
loo dhigay dhicidda iyo kicidda kuwa badan oo Israa'iil ku
jira, iyo calaamo ka gees ahaan lagaga hadlo, 35 si ay
qalbiyo badan fikirradoodu u muuqan doonaan. Adigana
seef baa naftaada ka mudhbixi doonta. 36 Waxaa jirtay
nebiyad Anna la odhan jiray, ina Fanuu'eel, oo ahayd qoladii
Aasheer, wayna da'weynayd; nin bayna la jirtay toddoba
sannadood bikradnimadeeda dabadeed. 37 Waxayna ahayd
carmal xataa afar iyo siddeetan sannadood, macbudkana
kama ay tegin, laakiin Ilaah ayay soon iyo salaad habeen iyo
maalinba ku caabudaysay. 38 Saacaddaas qudheeda ayay
soo gashay oo Ilaah u mahadnaqday, oo kuwa furashada
Yeruusaalem sugayay oo dhan ayay xaggiisa kala hadashay.
39 Goortay wax walba dhammeeyeen sida sharciga Rabbigu
leeyahay, waxay ku noqdeen Galili ilaa magaaladoodii
Naasared. 40 Wiilkii ayaa koray oo itaal weynaaday, waxaana
ka buuxsantay xigmad; Ilaah nimcadiisuna way dul joogtay.
41 Sannad walba waalidkiisii waxay Yeruusaalem u tegi jireen
Iiddii Kormaridda. 42 Goortuu laba iyo toban sannadood
jiray ayay aadeen sidii caadadii iiddu u ahayd. 43 Oo
goortay maalmihii dhammaysteen, oo ay noqonayeen, ayaa
Ciise wiilkii ahaa ku hadhay Yeruusaalem, waalidkiisuna
ma ogayn, 44 laakiin iyagoo u malaynaya inuu dadka
la socdo, ayay maalin sii socdeen, markaasay ka dhex
doondooneen xigaalkooda iyo kuway isbarteen. 45 Oo
markay heli waayeen ayay Yeruusaalem ku noqdeen oo
ka doondooneen. 46 Waxaa noqotay, saddex maalmood
dabadeed, inay macbudka ka heleen isagoo macallimiinta
dhex fadhiya oo dhegaysanaya oo wax weyddiinaya. 47
Dadkii maqlay oo dhan ayaa la yaabay garashadiisii iyo
jawaabihiisii. 48 Goortay arkeen isagii way la yaabeen, oo
hooyadiis ayaa ku tidhi, Wiilkaygiiyow, maxaad sidaas noo
yeeshay? Bal eeg, aniga iyo aabbahaa caloolxumo waannu
kugu doondoonnay. 49 Markaasuu wuxuu ku yidhi, Maxaad
ii doondoonayseen? Miyaanad ogayn inay igu waajib tahay
inaan danta Aabbahay ku jeedo? 50 Laakiin way garan
waayeen hadalkii uu kula hadlay. 51 Kolkaasuu raacay oo
Naasared tegey, wuuna ka dambeeyey iyaga; laakiinse
hooyadiis hadalkaas oo dhan qalbigeeda ayay ku haysatay.
52 Ciisena wuxuu ku koray xigmad iyo dherer iyo nimco,
Ilaah iyo dadka hortooda.

**3** Waxay ahayd sannaddii shan iyo tobnaad oo Tiberiyas
Kaysar boqranaa, markii Bontiyos Bilaatos xukumi jiray
Yahuudiya, oo Herodos taliye u ahaa Galili, walaalkiis
Filibosna taliye u ahaa Ituraya iyo dalkii Tarakhoonitis, oo
Lusaniyas taliye u ahaa Abilene, 2 oo Annas iyo Kayafas
wadaaddadii sare ahaan jireen, markaasaa ereygii Ilaah
cidlada ugu yimid Yooxanaa ina Sakariyas. 3 Wuxuu yimid
Webi Urdun hareerihiis oo dhan isagoo dadka ku wacdiyeya
baabtiiskii toobadda dembidhaafka aawadiis, 4 siday ugu
qoran tahay kitaabkii hadallada Nebi Isayos, Waa codka
kan cidlada kaga qaylinaya, Jidka Rabbiga hagaajiya,
Waddooyinkiisa toosiya. 5 Dooxo walba waa la buuxin
doonaa, Qar iyo buur walbana waa la gaabin doonaa, Wixii
qalloocanna waa la toosin doonaa, Jidadka xunxunna waa la
simi doonaa, 6 Uunka oo dhammuna badbaadinta Ilaah ayay
arki doonaan. 7 Haddaba wuxuu ku yidhi dadkii badnaa oo u
soo baxay inuu baabtiiso iyaga, Dhal jilbisay, yaa idiinka
digay inaad ka carartaan cadhada imanaysa? 8 Haddaba
midho toobad istaahila soo bixiya, hana bilaabina inaad

isku tidhaahdaan, Waxaannu leennahay Ibraahim oo aabbe
noo ah. Waayo, waxaan idinku leeyahay, Ilaah waa karaa
inuu dhagaxyadan carruur uga kiciyo Ibraahim. 9 Haddeer
weliba faaska waxaa la dhigay geedaha guntooda. Sidaa
darteed geed walba oo aan midho wanaagsan soo bixin
waa la gooyaa oo dabka lagu tuuraa. 10 Markaasaa dadkii
badnaa weyddiiyeen, oo waxay ku yidhaahdeen, Haddaba
maxaannu samaynaa? 11 Kolkaasuu u jawaabay oo iyagii
ku yidhi, Kii laba khamiis qabaa, ha siiyo kii aan waxba
qabin; kii cunto qabaana, sidaas oo kale ha yeelo. 12
Markaasaa waxaa u yimid cashuurqaadayaal in la baabtiiso,
waxayna ku yidhaahdeen, Macallimow, annaguna maxaannu
samaynaa? 13 Isaguna wuxuu ku yidhi, Waxaa laydiin
amray wax ka badan ha qaadanina. 14 Markaasaa askarna
weyddiisay oo ku tidhi, Annaguna maxaannu samaynaa?
Wuxuu iyagii ku yidhi, Ninna ha dulmina, oo ninna ha
masabidina; mushahaaradiinnana raalli ku ahaada. 15
Intii dadku filanayeen oo kulligoodna qalbiyadooda kaga
fikirayeen Yooxanaa inuu yahay Masiixii iyo in kale, 16 ayaa
Yooxanaa kulligood u jawaabay oo ku yidhi, Anigu waxaan
idinku baabtiisaa biyo, laakiin waxaa imanaya ku iga itaal
weyn, kan aanan istaahilin inaan yeelmihii kabihiisa furo.
Isagu wuxuu idinku baabtiisi doonaa Ruuxa Quduuska ah iyo
dab. 17 Masaftiisu gacantiisay ku jirtaa inuu goobtiisa wax
lagu tumo aad u safeeyo oo sarreenkana maqsinkiisa ku soo
ururiyo, laakiin buunshaha ayuu dab aan demeyn ku gubi
doonaa. 18 Digniin badan oo kale ayuu dadka ku wacdiyey.
19 Laakiin kolkuu taliye Herodos u canaantay walaalkiis
Filibos naagtiisii Herodiya aawadeed, iyo waxyaalaha xunxun
oo Herodos sameeyey oo dhan aawadood, 20 ayaa Herodos
waxan oo dhan weliba ku daray inuu Yooxanaa ku xidho
xabsigii. 21 Markii dadkii oo dhan la baabtiisay, waxaa
dhacay in Ciisena la baabtiisay, oo intuu tukanayay ayaa
samadu furantay, 22 oo Ruuxa Quduuska ah ayaa dushiisa
ku soo degay isagoo muuqasho jidh leh oo qoolley u eg,
waxaana samada ka yimid cod leh, Adigu waxaad tahay
Wiilkayga aan jeclahay; ee waan kugu faraxsanahay. 23 Oo
Ciise markuu bilaabay inuu wax baro, wuxuu ahaa qiyaas
soddon jir, isagoo ahaa (sida loo moodayay) ina Yuusuf, kan
ahaa ina Heli, 24 kan ahaa ina Matad, kan ahaa ina Laawi,
kan ahaa ina Malki, kan ahaa ina Yanna, 25 kan ahaa ina
Yuusuf, kan ahaa ina Matatiyas, kan ahaa ina Caamoos, kan
ahaa ina Na'uum, kan ahaa ina Esli, kan ahaa ina Naggay,
26 kan ahaa ina Ma'ad, kan ahaa ina Matatiyas, kan ahaa
ina Semey, kan ahaa ina Yuusuf, kan ahaa ina Yuuda, 27
kan ahaa ina Yo'anna, kan ahaa ina Reesa, kan ahaa ina
Serubaabel, kan ahaa ina Salaatii'eel, kan ahaa ina Neeri,
28 kan ahaa ina Malki, kan ahaa ina Addi, kan ahaa ina
Koosam, kan ahaa ina Elmoodam, kan ahaa ina Ceer, 29
kan ahaa ina Yooses, kan ahaa ina Eliiceser, kan ahaa ina
Yoorim, kan ahaa ina Matad, kan ahaa ina Laawi, 30 kan
ahaa ina Simecoon, kan ahaa ina Yuuda, kan ahaa ina
Yuusuf, kan ahaa ina Yoonam, kan ahaa ina Eliyaqiim, 31
kan ahaa ina Mele'as, kan ahaa ina Menna, kan ahaa ina
Matata, kan ahaa ina Naataan, kan ahaa ina Daa'uud, 32
kan ahaa ina Yesay, kan ahaa ina Coobeed, kan ahaa ina
Bocas, kan ahaa ina Salmoon, kan ahaa ina Naasoon, 33
kan ahaa ina Caminadaab, kan ahaa ina Araam, kan ahaa
ina Esroom, kan ahaa ina Feres, kan ahaa ina Yahuudah,
34 kan ahaa ina Yacquub, kan ahaa ina Isxaaq, kan ahaa
ina Ibraahim, kan ahaa ina Tara, kan ahaa ina Naakoor, 35
kan ahaa ina Seruukh, kan ahaa ina Ragaw, kan ahaa ina
Faleg, kan ahaa ina Xeber, kan ahaa ina Salah, 36 kan ahaa
ina Qaynaan, kan ahaa ina Arfaksad, kan ahaa ina Sheem,
kan ahaa ina Nuux, kan ahaa ina Lameg, 37 kan ahaa ina
Metushelax, kan ahaa ina Enoog, kan ahaa ina Yaared, kan
ahaa ina Mahalaleel, kan ahaa ina Qaynaan, 38 kan ahaa
ina Enoos, kan ahaa ina Seed, kan ahaa ina Aadan, kan
ahaa ina Ilaah.

4 Ciise waxaa ka buuxsamay Ruuxa Quduuska ah, oo Webi
Urdun ayuu ka noqday, oo Ruuxii baa cidlada u kaxeeyey.
2 Afartan maalmood ayaa Ibliisku jirrabayay. Maalmahaasna
waxba ma cunin. Goortay maalmihii dhammaadeen ayuu
gaajooday. 3 Markaasaa Ibliisku wuxuu ku yidhi, Haddaad
tahay Wiilka Ilaah ku dheh dhagaxan, Kibis noqo. 4 Ciise
baa u jawaabay oo ku yidhi, Waa qoran tahay, Dadku waa
inaanu kibis oo keliya ku noolaan. 5 Oo markuu kor u
kaxeeyey wuxuu wakhti yar ku tusay quruumaha dunida oo
dhan. 6 Markaasaa Ibliisku wuxuu ku yidhi, Amarkan oo
dhan waan ku siinayaa iyo ammaantoodaba, waayo, waa lay
siiyey; oo kii aan doonayo ayaan siiyaa. 7 Haddaba haddaad
hortayda i caabuddid, kulli adaa lahaan doona. 8 Markaasaa
Ciise u jawaabay oo ku yidhi, Waa qoran tahay, Waa inaad
caabuddo Rabbiga Ilaahaaga ah oo waa inaad isagoo keliya
u adeegto. 9 Markaasuu Yeruusaalem geeyey, wuxuuna
saaray munaaraddii macbudka oo ku yidhi, Haddaad tahay
Wiilka Ilaah, halkan hoos iskaga tuur; 10 waayo, waa qoran
tahay, Malaa'igihiisa ayuu ku amri doonaa inay ku ilaaliyaan,
11 iyo, Inay gacmahooda sare kuugu qabtaan inaanay
cagtaadu dhagax ku dhicin. 12 Ciise baa u jawaabay oo
ku yidhi, Waa la yidhi, Rabbiga Ilaahaaga ah waa inaanad
jirrabin. 13 Ibliiskiina markuu jirrabaad walba dhammeeyey
ayuu ka tegey intii wakhti ah. 14 Markaasaa Ciise wuxuu

xooggii Ruuxa kula noqday Galili, warkiisuna wuxuu gaadhay
dhulka ku wareegsan oo dhan. 15 Sunagogyadoodana ayuu
wax ku baray, dhammaanna waa la wada ammaanay isaga.
16 Markaasuu wuxuu yimid Naasared oo ahayd meeshuu
ku koray, oo maalintii sabtida sida caadadiisu ahayd ayuu
sunagogga galay, wuuna istaagay inuu wax akhriyo. 17
Waxaa loo dhiibay kitaabkii Nebi Isayos, oo goortuu kitaabkii
furay ayuu helay meeshii lagu qoray, 18 Ruuxii Rabbiga ayaa
i dul jooga, Waayo, wuxuu ii subkay inaan war wanaagsan
masaakiinta ku wacdiyo, Wuxuuna ii soo diray inaan kuwa
xidhan furriinnimada ogeysiiyo Iyo kuwa indhaha la' soo
celinta araggooda Iyo inaan kuwa nabaraysan soo furfuro,
19 Iyo inaan dadka ogeysiiyo sannadda qaabbilaadda ah
ee Rabbiga. 20 Intuu kitaabkii duudduubay ayuu midiidinka
u dhiibay oo fadhiistay; oo dadkii sunagoggii ku jiray oo
dhan ayaa indhaha ku taagay. 21 Markaasuu bilaabay
inuu ku yidhaahdo, Maanta Qorniinkan dhegihiinnu maqlay
waa rumoobay. 22 Kulligood markhaati bay ahaayeen,
wayna ka yaabeen hadallada nimcada leh oo afkiisa ka
soo baxay, markaasay yidhaahdeen, Kanu miyaanu ahayn
wiilkii Yuusuf? 23 Kolkaasuu ku yidhi, Shakila'aan waxaad
masaalkan igu odhan doontaan, Dhakhtarow, isbogsii. Wax
kastoo aannu maqalnay oo Kafarna'um lagu sameeyey,
halkan dhulkaagana ku samee. 24 Markaasuu ku yidhi, Runtii
waxaan idinku leeyahay, Nebina dalkiisa laguma aqbalo.
25 Laakiin runtii waxaan idinku leeyahay, Wakhtigii Eliyaas
waxaa Israa'iil ku jiray carmallo badan oo nimankoodii
ka dhinteen markii cirku saddex sannadood iyo lix bilood
xidhmay oo abaar weyni dhulka oo dhan ka dhacday. 26
Laakiin middoodna Eliyaas looma dirin, naag carmal ah
oo magaalada Sarefta oo dalka Siidoon ku jirtay maahee.
27 Wakhtigii Nebi Eliishaana waxaa Israa'iil ku jiray dad
badan oo baras leh, midkoodna lama daahirin Nacamaan
reer Suuriya maahee. 28 Markii kuwii sunagogga ku jiray
oo dhan waxaas maqleen ayay aad u cadhoodeen. 29
Markaasay kaceen oo magaaladii ka saareen, waxayna
u kaxeeyeen buurtii magaaladoodii ka dhisnayd qarkeedii
inay ka tuuraan. 30 Laakiin isagu intuu dhex maray ayuu
iska tegey. 31 Wuxuuna u degay Kafarna'um oo magaalada
Galili ah. Oo maalmihii sabtida ayuu dadka wax barayay. 32
Waxbariddiisiina way la yaabeen, waayo, hadalkiisu amar
buu lahaa. 33 Waxaana sunagogga joogay nin jinni wasakh
leh qaba. Cod weyn ayuu ku qayliyey, oo wuxuu yidhi, 34
Na daa! Maxaa inoo dhexaya, Ciise reer Naasaredow?
Ma waxaad u timid inaad na baabbi'iso? Anigu waa ku
garanayaa kii aad tahay, Kan Quduuska ah ee Ilaah. 35
Ciise baa canaantay oo ku yidhi, Aamus oo ka soo bax.
Jinniguna goortuu ninkii dhexda ku tuuray ayuu ka soo
baxay, waxbana ma uu yeelin. 36 Yaab weyn ayaa ku wada
dhacay; wayna isla wada hadleen oo yidhaahdeen, Waa
maxay hadalkan? waayo, jinniyada wasakhda leh ayuu
amar iyo xoog ku xukumaa, wayna ka baxaan. 37 Meel
kasta oo dalka ku wareegsan ayaa warka isaga ku saabsan
gaadhay. 38 Markaasuu sunagoggi ka soo kacay, oo wuxuu
galay gurigii Simoon. Simoon soddohdiisna qandho weyn
ayay qabtay, markaasay isaga u baryeen aawadeed, 39
oo intuu isa soo dul taagay ayuu qandhadii canaantay,
wayna daysay. Kolkiiba way kacday oo u adeegtay iyagii. 40
Markii qorraxdu sii dhacaysay, dadkii oo dhan oo lahaa dad
cudurro kala cayncayn ah qabay ayay isaga u keeneen; mid
kastaba gacmihiisuu saaray oo bogsiiyey. 41 Jinniyona dad
badan ayay ka soo baxeen, iyagoo qaylinaya oo leh, Adigu
waxaad tahay Wiilka Ilaah. Isaguse waa canaantay oo uma
oggolaanin inay hadlaan, waayo, waxay garanayeen inuu
Masiixa yahay. 42 Goortii ay maalintii noqotay, ayuu baxay
oo meel cidla ah tegey; dadkii badnaana way doondooneen
oo u yimaadeen. Wayna qabteen si aanu uga tegin. 43
Laakiin wuxuu iyagii ku yidhi, Waa inaan magaalooyinka
kalena injiilka boqortooyada Ilaah ku wacdiyo, waayo, sidaa
darteeda waa la ii soo diray. 44 Sunagogyada Galilina ayuu
dadka ka dhex wacdiyi jiray.

5 Intii dadkii oo dhan isku soo cidhiidhiyeen inay ereygii
Ilaah maqlaan, ayuu is-ag taagay badda Gennesared; 2
oo wuxuu arkay laba doonniyood oo badda ag taal; laakiin
kalluumaystayaashii waa ka degeen, oo shabagyadoodii
ayay maydhayeen. 3 Markaasuu fuulay doonniyihii middood
oo Simoon lahaa, wuxuuna ka baryay inuu in yar dhulka ka
durkiyo. Markaasuu fadhiistay oo dadkii wax ka dhex baray
doonnidii. 4 Goortuu hadalkii dhammeeyey ayuu Simoon
ku yidhi, Meesha biyaha u dheer gee, oo shabagyadiinna
ku dejiya si aad kalluun u heshaan. 5 Simoon baa u
jawaabay oo ku yidhi, Macallimow, xalay oo dhan ayaannu
hawshoonnay, waxbana ma aannu qaban, laakiin hadalkaaga
dartii shabagyada waan dejinayaa. 6 Goortay waxaas yeeleen
waxay ku qabteen kalluun tiro badan, shabagyadooduna
way kala dillaaci gaadheen. 7 Markaasay u gacan haadiyeen
wehelladoodii doonnida kale ku jiray inay yimaadaan oo
caawiyaan. Wayna yimaadeen, oo waxay buuxiyeen labadii
doonniyood, sidaa darteed ayay u dhowaadeen inay degaan.
8 Laakiin Simoon Butros goortuu waxaas arkay, ayuu Ciise
jilbihiisa isku tuuray, oo wuxuu ku yidhi, Sayidow, waxaan
ahay nin dembi leh, ee iga tag. 9 Maxaa yeelay, isaga iyo
kuwii la jirayba, waxay la yaabeen kalluunkii badnaa oo

ay qabteen. **10** Sidoo kalena waxaa la yaabay Yacquub
iyo Yooxanaa oo wiilashii Sebedi ahaa, kuwii wehello
Simoon la ahaa. Ciisena wuxuu Simoon ku yidhi, Ha baqin,
hadda iyo hadhowba dad baad jillaabi doontaa. **11** Markay
doonniyahoodii dhulkii geeyeen, ayay wax walba ka tageen,
markaasay raaceen isaga. **12** Goortuu magaalooyinka
middood ku jiray, waxaa la arkay nin baras miidhan ah.
Isaguna markuu Ciise arkay, wejigiisuu dhulka dhigay oo
ka baryay isagoo leh, Sayidow, haddaad doonaysid waad i
daahirin kartaa. **13** Oo intuu gacantiisa soo taagay, ayuu
taabtay, oo ku yidhi, Waan doonayaa ee daahirsanow. Oo
kolkiiba baraskii waa ka baxay. **14** Markaasuu ku amray,
Ninna ha u sheegin, laakiin jidkaaga mar oo wadaadka
istus. Waxaad daahirsanaantaada u bixisaa wixii Muuse
amray, marag iyaga ha u ahaatee. **15** Laakiin weliba
warkii isaga ku saabsanaa ayaa sii fiday; o dad aad u
badan ayaa u yimid inay maqlaan, iyo in bukaankooda
laga bogsiiyo. **16** Markaasuu, intuu ku noqday meelo cidla
ah, ku tukaday. **17** Maalmahaas middood waxaa dhacay
inuu wax barayay, oo halkaasna waxaa ag fadhiyey qaar
Farrisiinta iyo macallimiintii sharciga ah oo ka yimid magaalo
walba oo Galili iyo Yahuudiya iyo Yeruusaalem; xoogga
Rabbiguna waa la jiray isaga si uu u bogsiiyo kuwa buka. **18**
Markaasaa niman waxay sariir ku soo qaadeen nin curyaan
ah, waxayna doonayeen inay gudaha geliyaan oo hortiisa
dhigaan. **19** Markay heli waayeen meel ay ka geliyaan dadkii
badnaa aawadiis, ayay guriga dushiisa fuuleen, oo saqafka
ayay ka dusiyeen isaga iyo sariirtiisii, oo ay dhex dhigeen
Ciise hortiisa. **20** Goortuu rumaysadkoodii arkay ayuu ku
yidhi, Nin yahow, dembiyadaadu waa kaa cafiyan yihiin.
**21** Markaasaa culimmadii iyo Farrisiintii waxay bilaabeen
inay fikiraan iyagoo leh, Ayuu yahay kan caytamayaa? Ayaa
dembiyo cafiyi kara Ilaah keliya maahee? **22** Laakiin Ciise
goortuu fikirradoodii gartay ayuu u jawaabay oo ku yidhi,
Maxaad qalbiyadiinna uga fikiraysaan? **23** Iyamaa hawl yar,
in la yidhaahdo, Dembiyadaadu waa kaa cafiyan yihiin,
ama in la yidhaahdo, Kac oo soco? **24** Laakiin si aad ku
garataan in Wiilka Aadanahu dhulka ku leeyahay amar
uu dembiyada ku cafiyo (ayuu ninkii curyaanka ahaa ku
yidhi), Waxaan kugu leeyahay, Kac oo sariirtaada qaado oo
gurigaaga tag. **25** Kolkiiba hortood ayuu kacay, oo qaatay
wixii uu ku jiifay, oo gurigiisa tegey, isagoo Ilaah ammaanaya.
**26** Markaasay wada yaabeen oo Ilaah ammaaneen, aad
bayna u baqeen, oo waxay yidhaahdeen, Maanta waxaannu
aragnay waxyaalo yaab leh. **27** Waxyaalahaas dabadood
ayuu baxay, oo wuxuu arkay cashuurqaade Laawi la odhan
jiray oo fadhiya meeshii cashuurta lagu qaado, oo wuxuu
ku yidhi, I soo raac. **28** Markaasuu wax walba ka tegey,
wuuna kacay oo raacay. **29** Laawi wuxuu gurigiisa ugu
sameeyey diyaafad weyn. Waxaana joogay qaar badan oo
cashuurqaadayaal ah iyo qaar kale oo cunto ula fadhiya
iyaga. **30** Markaasaa Farrisiintii iyo culimmadoodii, intay
xertiisii ka gunuunaceen, waxay ku yidhaahdeen, Maxaad
cashuurqaadayaasha iyo dembilayaasha wax ula cuntaan
oo ula cabtaan? **31** Ciise ayaa u jawaabay oo ku yidhi,
Kuwa ladan dhakhtar uma baahna, laakiin kuwa buka ayaa
u baahan. **32** Anigu uma aan imanin inaan kuwa xaqa ah
u yeedho, laakiin inaan dembilayaashase toobadda ugu
yeedho ayaan u imid. **33** Waxay ku yidhaahdeen, Xerta
Yooxanaa marar badan bay soomaan oo tukadaan, kuwa
Farrisiintuna sidaas oo kale ayay yeelaan, laakiin kuwaagu
wax bay cunaan oo cabbaan. **34** Ciise wuxuu ku yidhi, Ma ku
dirqi karaysaan saaxiibbadii arooska inay soomaan kolkuu
aroosku la joogo? **35** Laakiin maalmaha ayaa iman doona;
oo kolkii arooska laga qaadi doono, kolkaasay maalmahaas
soomi doonaan. **36** Weliba wuxuu kula hadlay masaal isagoo
leh, Ninna karriin kama jeexo dhar cusub inuu dhar duug ah
ku tolo, haddii kale tan cusub ayuu jeexayaa, oo karriintii laga
soo gooyay dharkii cusbaa la heshiin mayso kan duugga
ah. **37** Ninna khamri cusub kuma shubo qarbeddo duug
ah, haddii kale khamrigii cusbaa ayaa qarbeddada kala
dildillaacinaya, oo waa daadanayaa; qarbeddaduna waa
hallaabayaan. **38** Laakiin khamri cusub waa in lagu shubaa
qarbeddo cuscusub. **39** Ma jiro nin, hadduu khamri duug ah
cabbay, doonaya kan cusub, waayo, wuxuu leeyahay, Kan
duugga ah ayaa wanaagsan.

**6** Maalin sabti ah waxaa dhacay inuu beeraha dhex
marayay, xertiisuna waxay jarteen sabuulladii, oo intay
gacmahooda ku xoqeen ayay cuneen. **2** Laakiin Farrisiintii
qaarkood waxay ku yidhaahdeen, Maxaad u samaynaysaan
wixii aan xalaal ahayn in sabtida la sameeyo? **3** Ciise
ayaa u jawaabay oo ku yidhi, Miyaydnaan akhriyin wixii
Daa'uud sameeyey goortuu gaajooday, isaga iyo kuwii la
jiray, **4** siduu gurigii Ilaah u galay oo uu u qaaday kibistii
tusniinta oo u cunay oo u siiyey kuwii la jiray, tan aan xalaal
u ahayn in la cuno wadaaddada maahee? **5** Markaasuu
iyagii ku yidhi, Wiilka Aadanahu waa sayidka sabtida. **6**
Waxaa sabti kale dhacay inuu sunagogga galay oo wax ku
baray; halkaasna waxaa joogay nin gacantiisa midigeed
engegnayd. **7** Culimmadii iyo Farrisiintii ayaa fiirinayay inuu
sabtida wax bogsiinayo iyo in kale, si ay ugu helaan wax
ay ku ashtakeeyaan. **8** Isaguse wuxuu gartay fikirradoodii;
goortaasuu ninkii gacanta engegnaa ku yidhi, Kac oo dhexda

isa soo taag. Wuuna kacay oo istaagay. 9 Ciise wuxuu
ku yidhi, Wax baan idin weyddiinayaa, Sabtida ma xalaal
baa in wanaag la falo ama shar, in naf la badbaadiyo ama
in la dilo? 10 Markaasuu isha wada mariyey, wuxuuna
ninkii ku yidhi, Gacantaada soo taag. Markaasuu yeelay
sidaas, gacantiisuna waa bogsatay. 11 Markaasay aad u
cadhoodeen, oo waxay ka wada hadleen waxay Ciise ku
samayn lahaayeen. 12 Maalmahaas waxaa dhacay inuu
buurta u baxay inuu tukado. Habeenkii oo dhan wuxuu
waday inuu Ilaah u tukado. 13 Oo goortay maalin noqotay
ayuu xertiisii u yeedhay. Markaasuu laba iyo toban ka soo
saaray, wuxuuna u bixiyey rasuullo; 14 oo waxay ahayeen
Simoon, kan uu Butros u bixiyey, iyo walaalkiis Andaros,
iyo Yacquub iyo Yooxanaa, iyo Filibos iyo Bartolomayos,
iyo 15 Matayos iyo Toomas, iyo Yacquub ina Alfayos,
iyo Simoon oo la odhan jiray Qiiroleh, 16 iyo Yuudas
ina Yacquub, iyo Yuudas Iskariyod, kii gacangeliyey. 17
Markaasuu hoos ula degay, oo bannaan ayuu istaagay,
isaga iyo qaar badan oo xertiisa ah, iyo dad badan oo
Yahuudiya iyo Yeruusaalem iyo xeebaha Turos iyo Siidoon
uga yimaadeen inay maqlaan iyo in cudurradooda laga
bogsiiyo. 18 Oo kuwo jinniyo wasakh leh derdereenna waa la
bogsiiyey. 19 Dadkii badnaa oo dhan waxay doonayeen inay
taabtaan isaga, waayo, xoog baa ka soo baxay oo wada
bogsiiyey. 20 Markaasuu kor u fiiriyey oo xertiisii eegay oo ku
yidhi, Waxaa barakaysan kuwiinna masaakiinta ah, waayo,
boqortooyadii Ilaah idinkaa leh. 21 Waxaana barakaysan
kuwiinna haddeer gaajaysan, waayo, waad dhergi doontaan.
Waxaana barakaysan kuwiinna haddeer ooyaya, waayo,
waad qosli doontaan. 22 Waad barakaysan tihiin goortii dadku
idin necbaado, oo goortay dhexdooda idinka saaraan, oo
idin caayaan, oo magacyadiinna sida wax shar leh u tuuraan
Wiilkii Aadanaha aawadiis. 23 Maalintaas reyreeya oo farxad
ku boodbooda, waayo, bal ogaada, abaalgudkiinnu waa ku
weyn yahay jannada, waayo, awowayaashood sidaasay
nebiyadii ku samayn jireen. 24 Hoog waxaa leh kuwiinna
hodanka ah, waayo, gargaarkiinna waad hesheen. 25 Hoogna
waxaa leh kuwiinna haddeer dheregsan, waayo, waad
gaajoon doontaan; hoogna waxaa leh kuwiinna haddeer
qoslaya, waayo, waad barooran doontaan oo ooyi doontaan.
26 Waa idiin hoog markii dadka oo dhammu wanaag idinka
sheego, waayo, awowayaashood sidaasay nebiyadii beenta
ahaa ku samayn jireen. 27 Laakiin waxaan idinku leeyahay
kuwiinna maqlaya, Cadowyadiinna jeclaada, kuwa idin
necebna wax wanaagsan u sameeya. 28 Kuwa idin habaara
u duceeya, kuwa idin caayana Ilaah u barya. 29 Kii dhabanka
kaa dhirbaaxa, kan kalena u du; oo kii maradaada kaa qaata,
khamiiskaagana ha ka celin. 30 Mid walba oo wax kaa
barya, sii; kii waxaaga qaatana, ha ka baryin. 31 Oo sidaad
doonaysaan in dadku idiin sameeyo, idinkuna sidaas oo kale
u sameeya iyaga. 32 Haddaad jeceshihiin kuwa idin jecel,
mahadmaad heshaan? Waayo, xataa dembilayaashuba way
jecel yihiin kuwa jecel iyaga. 33 Haddaad wanaag u fashaan
kuwa wanaag idiin fala, mahadmaad heshaan? Waayo,
xataa dembilayaashuba sidaasay yeelaan. 34 Haddaad wax
amaahisaan kuwa aad ka rajaynaysaan inaad ka heshaan,
mahadmaad heshaan? Waayo, xataa dembilayaashuba
way amaahiyaan dembilayaasha inay ka helaan intii oo
kale. 35 Laakiin cadowyadiinna jeclaada, oo wanaag u
sameeya, oo amaahiya, idinkoo aan waxba ka rajaynaynin,
abaalgudkiinnuna waa badan doonaa, oo waxaadna noqon
doontaan wiilashii Kan ugu sarreeya, waayo, isagu waa u
roon yahay kuwa aan mahadnaqin iyo kuwa sharka leh.
36 Naxariis lahaada sida Aabbihiin naxariis u leeyahay.
37 Cidna ha xukumina, idinkana laydinma xukumi doono.
Ninnana wax ha ku garaynina, idinkana wax laydinkuma
garayn doono e; dhaafa oo waa laydin dhaafi doonaa. 38
Siiya oo waa laydin siin doonaa; qiyaas wanaagsan oo hoos
u riixriixan oo ruxan oo buuxdhaafaya ayaa laydinku siin
doonaa faraqiinna, waayo, qiyaastii aad ku qiyaastaan ayaa
laydiinku qiyaasi doonaa. 39 Markaasuu masaal kula hadlay.
Indhoole indhoole ma hagi karaa? Labadoodu miyaanay
god ku dhici doonin? 40 Qof xer ah macallinkiisa kama
sarreeyo, laakiin mid walba markuu wanaag u dhan yahay
wuxuu noqon doonaa sida macallinkiisa oo kale. 41 Saxarka
isha walaalkaa ku jira maxaad u aragtaa, dogobka ishaada
ku jirase aad u fiirsan weydaa? 42 Sidee baad walaalkaa
ugu odhan kartaa, Walaalow i daa, saxarka ishaada ku jira
aan kaa saaree, adiga oo aan arkaynin dogobka ishaada
ku jira? Labawejiile yahow, horta dogobka ishaada ku jira
iska saar, goortaasaad bayaan u arkaysaa inaad saxarka
isha walaalkaa ku jira ka saarto. 43 Waayo, ma jiro geed
wanaagsan oo midho xun dhalaa, welibana ma jiro geed xun
oo midho wanaagsan dhalaa. 44 Maxaa yeelay, geed kasta
waxaa laga garanayaa midhihiisa. Waayo, berde lagama
guro qudhac, canabkana lagama guro geed qodxan leh. 45
Ninka wanaagsan wuxuu maalka wanaagsan oo qalbiga
ku jira ka soo saaraa wax wanaagsan; kan sharka lehna
wuxuu sharka ka soo saaraa wax shar ah; waayo, afkiisu
wuxuu ku hadlaa waxa qalbiga ku badan. 46 Maxaad iigu
yeedhaan, Rabbow, Rabbow, oo aad u yeeli weydaan wixii
aan leeyahay? 47 Kii kasta oo ii yimaada, oo ereyadayda
maqla, oo yeela, waxaan idin tusayaa kuu u eg yahay. 48
Isagu wuxuu u eg yahay nin guri dhisay, oo qoday oo hoos u

dheereeyey; aasaaskiina ayuu dhagax weyn ka dul dhisay.
Goortii daadku yimid ayaa webigu ku soo jabay gurigaas,
xoog uu ku gilgilose ma lahayn, waayo, si wanaagsan ayaa
loo dhisay. 49 Laakiin kii maqla oo aan yeelin, wuxuu u eg
yahay nin dhulka ka dhisay guri aan aasaas lahayn. Kan
webigu ku soo jabay, oo kolkiiba ayuu dumay, oo dumiddii
gurigaasu waa weynayd.

7 Goortuu hadalladiisa ku dhammeeyey dadka
dhegaysadkooda ayuu Kafarna'um galay. 2 Boqol-u-
taliye addoonkiisii uu jeclaa ayaa bukay oo dhimashuu
u dhowaa. 3 Goortuu maqlay wax Ciise ku saabsan,
ayuu waayeelladii Yuhuudda u diray isaga, oo ka baryay
inuu yimaado oo addoonkiisa bogsiiyo. 4 Goortay Ciise
u yimaadeen, aad bay u baryeen oo ku yidhaahdeen,
Isagu waa istaahilaa inaad waxaas u yeeshid, 5 waayo,
quruunteenna ayuu jecel yahay, oo sunagog ayuu noo
dhisay. 6 Markaasaa Ciise raacay, oo isagoo aan guriga ka
fogayn, ayaa boqol-u-taliyihii saaxiibbo u soo diray oo ku
yidhi, Sayidow, ha isdhibin, waayo, anigu ma istaahilo inaad
saqafka gurigayga hoostiisa soo gashid. 7 Saas aawadeed
uma aan malaynaynin inaan istaahilo inaan kuu imaado;
laakiin hadal dheh, midiidinkayguna waa bogsan doonaa. 8
Waayo, anigu waxaan ahay nin laga sarreeyo, oo askar baa
iga hoosaysa. Kan waxaan ku idhaahdaa, Tag, wuuna tagaa;
mid kalena, Kaalay, wuuna yimaadaa; midiidinkaygana,
Waxan samee, wuuna sameeyaa. 9 Goortuu Ciise taas
maqlay, wuu ka yaabay, oo intuu dadkii la socday ku jeestay
ayuu ku yidhi, Waxaan idinku leeyahay, Rumaysad sidaas u
weyn oo kale reer binu Israa'iil kama dhex helin. 10 Kuwii
la soo dirayna kolkay gurigii ku noqdeen, waxay heleen
addoonkii oo ladan. 11 Markii dambe waxaa noqotay inuu
galay magaalada Na'in la odhan jiray; waxaana raacay
xertiisii, iyo dad badanba. 12 Oo goortuu iriddii magaalada
ku soo dhowaaday, waxaa dibadda loo waday nin meyd ah
oo madi u ahaa hooyadiis; iyaduna waxay ahayd carmal.
Oo waxaa iyada la jiray dad badan oo magaalada. 13
Rabbigu goortuu arkay iyada, ayuu u naxariistay oo ku yidhi,
Ha ooyin. 14 Oo intuu ku soo dhowaaday, ayuu taabtay
rabrabtii. Kuwii sidayna way joogsadeen. Markaasuu yidhi,
Dhallinyarow, waxaan kugu leeyahay, Kac. 15 Kolkaasaa
kii dhintay sara fadhiistay oo bilaabay inuu hadlo, oo
markaasaa Ciise isagii u dhiibay hooyadiis. 16 Kulligood
baqdin baa ku wada dhacday, oo Ilaah bay ammaaneen
iyagoo leh, Nebi weyn ayaa dhexdeenna ka kacay. Ilaahna
waa soo booqday dadkiisa. 17 Warkaas isaga ku saabsan
ayaa gaadhay Yahuudiya oo dhan iyo dhulka ku wareegsan
oo dhan. 18 Yooxanaa xertiisa ayaa waxaas oo dhan uga
warrantay. 19 Markaasaa Yooxanaa wuxuu u yeedhay
laba xertiisii ah oo Ciise u soo diray, oo ku yidhi, Miyaad
tahay kan imanaya mise mid kalaannu dhawrnaa? 20
Nimankii goortay u yimaadeen, waxay ku yidhaahdeen,
Yooxanaa Baabtiisaha ayaa noo soo kaa diray isagoo leh,
Miyaad tahay kan imanaya mise mid kalaannu dhawrnaa?
21 Saacaddaas qudheeda ayuu dad badan ka bogsiiyey
bukaankooda iyo cudurradooda iyo jinniyadooda sharka
leh. Indhoolayaal badanna wuxuu ugu roonaaday inay
wax arkaan. 22 Markaasaa Ciise u jawaabay oo ku yidhi,
Taga oo Yooxanaa uga warrama waxaad aragteen iyo
waxaad maqasheen. Kuwii indhaha la'aa wax bay arkaan,
kuwii lugahala'aana way socdaan, kuwii baraska qabayna
waa la nadiifiyey, kuwii dhegahala'aana wax bay maqlaan,
kuwii dhintayna waa la kiciyey, masaakiintana injiilka waa
lagu wacdiyaa, 23 oo waxaana barakaysan kan aan iga
xumaanin. 24 Kuwii Yooxanaa diray goortay tageen, wuxuu
bilaabay inuu dadkii badnaa wax uga sheego Yooxanaa.
Maxaad cidlada ugu baxdeen? Ma waxay ahayd inaad soo
aragtaan cawsduur dabaylu ruxayso? 25 Laakiin maxaad u
baxdeen? Ma waxay ahayd inaad soo aragtaan nin dhar
jilicsan qaba? Kuwa dharka wanaagsan qaba oo hodan ku
nool waxay joogaan guryaha boqorrada. 26 Laakiin maxaad
u baxdeen? Ma waxay ahayd inaad nebi soo aragtaan?
Haah, waxaan idinku leeyahay, Mid nebi ka sarreeya.
27 Kanu waa kii laga qoray, Eeg, waxaan hortaada soo
dirayaa wargeeyahayga, Kan jidkaaga ku sii diyaargarayn
doona hortaada. 28 Waxaan idinku leeyahay, Intii dumar
ka dhalatay, mid Yooxanaa ka weyn ma jiro, laakiin kan
boqortooyada Ilaah ugu yar ayaa ka weyn. 29 Dadkii maqlay
oo dhan iyo cashuurqaadayaashiiba waxay caddeeyeen
inuu Ilaah yahay xaq, iyagoo ah kuwii lagu baabtiisay
baabtiiskii Yooxanaa. 30 Laakiin Farrisiintii iyo kuwii sharciga
yiqiin ayaa waanadii Ilaah naftooda darteed u diiday iyagoo
aan Yooxanaa baabtiisin. 31 Haddaba maxaan nimanka
qarnigan u ekaysiiyaa? Maxay u eg yihiin? 32 Waxay u
eg yihiin carruur suuqa fadhida oo isu yeedhyeedhaysa
iyagoo leh, Biibiile baannu idiin yeedhinnay, oo waad cayaari
weydeen, waannu baroorannay oo waad ooyi weydeen. 33
Waayo, Yooxanaa Baabtiisaha waa yimid isagoo aan kibis
cunaynin oo aan khamri cabbaynin; waxaadna tidhaahdaan,
Jinni buu qabaa. 34 Wiilka Aadanahu waa yimid isagoo
wax cunaya oo cabbaya, waxaadna tidhaahdaan, Eeg,
waa nin cir weyn oo khamriyacab ah oo saaxiib la ah
cashuurqaadayaal iyo dembilayaal. 35 Xigmaddu inay xaq
tahay waa laga caddeeyey xaggii carruurteeda oo dhan. 36

Farrisiinta midkood ayaa weyddiistay inuu wax la cuno,
wuuna galay gurigii Farrisiga oo cunto u fadhiistay. 37 Bal
eeg, naag magaalada joogtay oo dembi lahayd goortay
ogaatay inuu gurigii Farrisiga cunto u fadhiyo, waxay soo
qaadatay weel alabastar ah oo cadar ku jiro. 38 Way
isdaba taagtay cagihiisa agtooda iyadoo ooyaysa, waxayna
bilaabtay inay ilmada cagihiisa ku qoyso, oo ay timaha
madaxeeda ku tirtirto, oo cagihiisay dhunkatay, oo cadarkii
marisay. 39 Farrisigii u yeedhay isaga, goortuu arkay, ayuu
isla hadlay isagoo leh, Ninkan hadduu nebi yahay, wuu
ogaan lahaa naagtan taataabatay cid ay tahay iyo waxay
tahay inay tahay dembile. 40 Ciise baa u jawaabay oo ku
yidhi, Simoonow, hal baan ku leeyahay. Wuxuu yidhi, Dheh,
Macallimow. 41 Waxaa jiray amaahiye laba nin amaah ku
lahaa, mid wuxuu ku lahaa shan boqol oo dinaar, midka
kalena konton. 42 Goortii ay waayeen waxay bixiyaan, ayuu
labadoodiiba u dhaafay. Haddaba iyamaa ahaan doona
kan jacayl badan? 43 Simoon baa u jawaabay oo ku yidhi,
Waxaan u malaynayaa, kan uu wax badan u dhaafay. Wuxuu
ku yidhi, Si hagaagsan baad u qiyaastay. 44 Kolkaasuu
naagtii u jeestay, oo wuxuu Simoon ku yidhi, Naagtan
ma aragtaa? Anigu gurigaagaan galay; biyo cagahayga
iima aad siin, laakiin iyadu cagahayga ayay ilmadeeda ku
qoysay oo ay timaheeda ku tirtirtay. 45 Dhunkasho ima
aad dhunkan, iyaduse tan iyo wakhtigaan soo galay kama
dayn inay cagahayga dhunkato. 46 Madaxaygana saliid
ma aad marin, iyaduse cagahayga ayay cadar marisay.
47 Sidaa darteed waxaan kugu leeyahay, Dembiyadeedii
badnaa waa cafiyan yihiin, waayo, aad bay u jeclayd. Kii
wax yar loo dhaafay, ayaa wax yar jecel. 48 Wuxuu iyada ku
yidhi, Dembiyadaadii waa cafiyan yihiin. 49 Kuwii cunto ula
fadhiyey waxay bilaabeen inay isku yidhaahdaan, Yuu yahay
kan dembiyo cafiya haddana? 50 Wuxuu naagtii ku yidhi,
Rumaysadkaaga ayaa ku badbaadiyey ee nabad ku tag.

8 Markii dambe waxaa dhacay inuu magaalooyinka iyo
tuulooyinka dhex marayay isagoo dadka ku wacdiyaya
oo u sheegaya injiilka boqortooyadii Ilaah; waxaana la jiray
laba-iyo-tobankii, 2 iyo naago laga bogsiiyey jinniyo shar leh
iyo cudurro. Waxay ahaayeen Maryantii la odhan jiray tii
reer Magdala, ee toddoba jinni ka baxeen, 3 iyo Yo'anna
afadii Khusas ee wakiilkii Herodos ahaa, iyo Susanna, iyo
qaar badan oo kale oo waxooda ugu adeegi jiray. 4 Goortii
dad badan isu soo urureen, iyo kuwa magaalo walba uga
yimid, wuxuu ku hadlay masaal. 5 Beerrey baa baxay inuu
abuurkiisa beero, oo intuu beerayay, qaar baa jidka geestiisa
ku dhacay, oo waa lagu tuntay, oo shimbirrihii cirka ayaa
cunay. 6 Qaar kalena waxay ku dhaceen dhagax; kol alla
kolkii ay soo baxeen way engegeen, waayo, qoyaan ma
lahayn. 7 Qaar kalena waxay ku dhex dhaceen qodxan,
qodxantiina waa la soo baxday oo ceejisay. 8 Qaar kalena
dhul wanaagsan bay ku dhaceen oo soo baxeen, waxayna
midho dhaleen boqol jibbaar. Goortuu waxan yidhi, ayuu
qayliyey oo yidhi, Kan dhego wax lagu maqlo lahu ha maqlo.
9 Markaasaa xertiisii weyddiisay oo ku tidhi, Muxuu yahay
masaalkan? 10 Wuxuu ku yidhi, Idinka waa laydin siiyaa
inaad waxa qarsoon ee boqortooyadii Ilaah garataan, kuwa
kalese masaallo ayaa loogu sheegaa, si ay goortay arkayaan
ayan u arkin, oo si ay goortay maqlayaan ayan u garan. 11
Masaalku waa kan: Abuurku waa ereygii Ilaah. 12 Kuwii
jidka yiil waa kuwa maqla, markaasaa Ibliisku yimaadaa, oo
hadalka ayuu qalbigooda ka qaadaa, si aanay u rumaysan
oo aanay u badbaadin. 13 Kuwii dhagaxa yiilna waa kuwa
goortay maqlaan, hadalka farxad ku qaata, kuwanna xidid
ma leh; laakiin wakhti yar ayay rumaystaan, wakhtiga
duufsashadana way iska noqdaan. 14 Kuwii qodxanta ku
dhex dhacayna waa kuwan maqla oo intay socdaan waxaa
ceejiya welwelidda iyo hodantinimada iyo farxadda ifkan,
midho bisilna ma dhalaan. 15 Kuwa dhulka wanaagsanna
waxay yihiin kuwa, intay maqlaan, qalbi wanaagsan oo fiican
hadalka ku haysta, oo dulqaadasho ayay midho ku dhalaan.
16 Ma jiro nin, goortuu ilays shido, weel ku daboola, ama
sariir hoos geliya, laakiin wuxuu saaraa meeshii ilayska
si ay kuwa soo galaa iftiinka u arkaan. 17 Waayo, wax
qarsoon ma jiro oo aan soo muuqan doonin, wax daboolanna
ma jiro oo aan la garan doonin oo aan bannaan soo bixi
doonin. 18 Sidaa darteed u fiirsada sidaad u maqlaysaan,
waayo, ku alla kii wax haysta waa la siin doonaa, ku alla
kii aan waxba haysanse waa laga qaadi doonaa wixii loo
maleeyo inuu haysto. 19 Markaasaa waxaa isaga u yimid
hooyadiis iyo walaalihiis, wayna soo gaadhi kari waayeen
dadkii badnaa aawadood. 20 Oo waxaa lagu yidhi, Hooyadaa
iyo walaalahaa ayaa dibadda taagan oo doonaya inay ku
arkaan. 21 Laakiin wuxuu ugu jawaabay, Hooyaday iyo
walaalahay waa kuwan ereyga Ilaah maqla oo yeela. 22
Maalmahaas middood waxaa dhacay inuu doonni fuulay
isaga iyo xertiisiiba, wuxuuna iyaga ku yidhi, Dhanka kale
oo badda aan u gudubno, goortaasay dhaqaaqeen. 23
Laakiin intay socdeen ayuu seexday, oo waxaa baddii ku
soo dhacay duufaan weyn oo dabayl ah; doonnidiina ayaa
buuxsamaysay, oo halis bay ku jireen. 24 Markaasay isaga
u yimaadeen oo intay toosiyeen ayay ku yidhaahdeen,
Macallimow, Macallimow, waa lumaynaaye. Kolkaasuu kacay
oo canaantay dabayshii iyo hirarkii biyaha. Goortaasay

degeen oo xawaal baa dhacday. 25 Markaasuu wuxuu
iyaga ku yidhi, Rumaysadkiinnii meeh? Iyagoo baqaya oo
yaabban waxay isku yidhaahdeen, Haddaba yuu yahay
kan amra xataa dabaysha iyo biyaha oo ay yeelaan? 26
Waxay gaadheen dalka Gadareni ee ka soo hor jeeday
Galili. 27 Goortuu dhulka u degay waxaa la kulmay nin
magaalada ka yimid oo jinniyo qaba. Wakhti dheer dhar ma
sidan jirin, gurina ma joogi jirin, laakiin xabaalaha ayuu dhex
joogi jiray. 28 Goortuu arkay Ciise, ayuu qayliyey, hortiisana
ayuu isku tuuray oo cod weyn ayuu ku yidhi, Maxaa inoo
dhexeeya, Ciisow, adigoo ah Wiilka Ilaaha sarow? Waxaan
kaa baryayaa, Ha i silcin. 29 Waayo, wuxuu jinnigii wasakhda
lahaa ku amray inuu ninka ka baxo, maxaa yeelay, marar
badan ayuu qaban jiray, oo waxaa lagu xidhi jiray silsilado
iyo bircago, oo waa la ilaalin jiray; silsiladihiina wuu iska
gooyn jiray oo jinniguna cidlada ayuu u kaxayn jiray. 30
Markaasaa Ciise weyddiiyey oo ku yidhi, Magacaa? Oo
wuxuu ku yidhi, Liijon; waayo, jinniyo badan ayaa galay. 31
Markaasay ka baryeen inaanu amrin inay yamayska tagaan.
**(Abyssos g12)** 32 Halkaa waxaa joogay daaqsin doofaarro
badan ah oo buurta daaqaysa. Waxayna ka baryeen inuu
u fasaxo inay kuwaas galaan. Kolkaasuu u fasaxay. 33
Markaasay jinniyadii ninkii ka baxeen oo doofaarradii galeen.
Daqsintiina jarka hoos bay uga yaacday ilaa badda, wayna
ku bakhtiyeen. 34 Kuwii daajin jiray markay arkeen waxa
dhacay, ayay carareen oo dadkii magaalada iyo beerahaba
ayay u warrameen. 35 Kolkaasaa dadkii u soo baxay inay
arkaan wixii dhacay. Markaasay u yimaadeen Ciise, oo
waxay arkeen ninkii jinniyadu ka baxeen, isagoo ag fadhiya
Ciise cagihiisa oo dhar sita oo miyir qaba; wayna baqeen.
36 Kolkaasaa kuwii arkay waxay iyaga u sheegeen sida
jinnoolihii loo bogsiiyey. 37 Dadkii oo dhan oo dalka Gadareni
ku wareegsanaa ayaa baryay inuu ka noqdo iyaga, waayo,
baqdin weyn ayay baqeen. Markaasuu doonni fuulay, waana
noqday. 38 Laakiin ninkii jinniyadii ka baxeen ayaa ka
baryay isaga inuu raaco, laakiin wuu diray isagoo ku leh, 39
Gurigaaga ku noqo oo dadka ogeysii waxa weyn oo Ilaah
kuu sameeyey. Markaasuu tegey oo wuxuu magaalada oo
dhan ku naadiyey waxa weyn oo Ciise u sameeyey. 40 Markii
Ciise noqday ayaa dadkii badnaa farxad ku qaatay, waayo,
way wada sugayeen. 41 Oo bal eeg, waxaa yimid nin Yayros
la odhan jiray, oo taliyaha sunagogga ahaan jiray. Wuxuuna
isku riday Ciise cagihiisa oo ka baryay inuu gurigiisa galo.
42 Waayo, gabadh keliya buu lahaa, iyadoo abbaaraha laba
iyo toban sannadood jirtay, wayna sakaraadaysay. Laakiin
intuu socday dadkii badnaa ayaa cidhiidhiyey. 43 Naag
laba iyo toban sannadood dhiigbixid qabtay, oo wixii ay ku
noolaan lahayd oo dhan dhakhtarro ku bixisay, oo ku bogsan
kari weyday, midna xaggiisa, 44 ayaa dhabarkiisa timid oo
taabatay maradiisa darafteeda. Kolkiiba bixiddii dhiiggeeda
ayaa joogsatay. 45 Markaasaa Ciise yidhi, Yuu yahay kan i
taabtay? Markay wada dafireen, Butros iyo kuwa la jiray
waxay ku yidhaahdeen, Macallimow, dadkii badnaa ayaa
ku jiidhaya oo ku cidhiidhinaya. 46 Laakiin Ciise wuxuu
yidhi, Qof baa i taabtay, waayo, waxaan gartay in xoog iga
baxay. 47 Naagtii goortay aragtay inaanay qarsoonaan karin
ayay timid iyadoo gariiraysa, oo hortiisay isku ridday, oo
u caddaysay dadkii oo dhan hortooda waxay u taabatay
iyo siday markiiba u bogsatay. 48 Kolkaasuu wuxuu iyada
ku yidhi, Gabadhoy, rumaysadkaaga ayaa ku bogsiiyey
ee nabad ku tag. 49 Intuu weli hadlayay, waxaa gurigii
taliyaha sunagogga ka yimid nin ku leh, Gabadhaadii waa
dhimatay, ee Macallinka ha dhibin. 50 Laakiin Ciise goortuu
maqlay, wuxuu ugu jawaabay, Ha baqin ee iska rumayso,
wayna bogsan doontaa. 51 Markuu guriga yimid, ninna
uma oggolaanin inuu la galo, Butros, iyo Yooxanaa, iyo
Yacquub, iyo gabadha aabbeheed, iyo hooyadeed maahee.
52 Kulligood waxay u ooyayeen oo u barooranayeen iyada,
laakiin wuxuu ku yidhi, Ha ooyina, iyadu ma dhiman, waase
huruddaa. 53 Wayna ku qosleen, iyagoo og inay dhimatay.
54 Markaasuu dadkii oo dhan dibadda u saaray, oo uu
gacanteeda qabtay oo qayliyey isagoo leh, Yartoy, kac. 55
Ruuxeedii ayaa ku soo noqday, oo markiiba way kacday, oo
wuxuu amray in cunto la siiyo iyada. 56 Waalidkeedii waa
yaabeen, wuxuuse amray inaanay ninna u sheegin waxa
dhacay.

9 Laba-iyo-tobankii ayuu isugu yeedhay, wuxuuna siiyey
xoog iyo amar ay jinniyada oo dhan ku saaraan oo ay
cudurro ku bogsiiyaan. 2 Wuuna diray inay boqortooyadii Ilaah
ku wacdiyaan dadka oo ay bogsiiyaan kuwa buka. 3 Wuxuuna
ku yidhi, Waxba safarka ha u qaadanina, ama ul, ama qandi,
ama kibis, ama lacag. Laba khamiisna ha qaadanina. 4 Guri
alla gurigaad gashaan jooga, meeshaasna ka baxa. 5 Kuwa
alla kuwii aan idin soo dhowayn, markaad magaaladaas ka
baxdaan siigada cagihiinna ka dhabaandhaba inay marag ka
gees ah ku ahaato. 6 Markaasay baxeen, oo tuulooyinka
ayay dhex mareen, iyagoo injiilka ku wacdiyaya oo meel
walbaba kuwa buka ku bogsiinaya. 7 Markaasaa taliye
Herodos maqlay waxa dhacay oo dhan, wuuna shakiyey,
waayo, qaar baa yidhi, Yooxanaa ayaa kuwii dhintay ka soo
sara kacay, 8 qaarna waxay yidhaahdeen, Eliyaas ayaa soo
muuqday, qaar kalena waxay yidhaahdeen, Nebi nebiyadii
hore ah ayaa soo sara kacay. 9 Markaasaa Herodos wuxuu

yidhi, Yooxanaa madaxaan ka gooyay, Yuu yahay kan aan
waxan ka maqlayo? Oo wuxuu doonayay inuu arko. 10
Rasuulladii markay soo noqdeen ayay isaga u sheegeen
wixii ay sameeyeen. Wuuna waday oo keli ahaan u kaxeeyey
magaalada Beytsayda la odhan jiray. 11 Laakiin dadkii
badnaa, goortay ogaadeen, way soo raaceen. Markaasuuna
iyaga soo dhoweeyey, oo wuxuu kala hadlay wax ku saabsan
boqortooyadii. Ilaah, oo kuwii u baahnaa in la bogsiiyona
wuu bogsiiyey. 12 Goortii maalintii dhammaanaysay laba-
iyo-tobankii ayaa yimid iyagoo ku leh, Dadka badan dir si
ay u tagaan tuulooyinka iyo beeraha ku wareegsan, oo
ay ugu hoydaan oo cunto uga helaan, waayo, meeshan
cidlada ah ayaynu joognaa. 13 Wuxuuse ku yidhi, Idinku
siiya waxay cunaan. Waxay ku yidhaahdeen, Annagu wax
ka badan shan kibsood iyo laba kalluun ma hayno, inaannu
tagno oo dadkan oo dhan cunto u soo iibinno maahee. 14
Waayo, waxay ku dhowaayeen shan kun oo nin. Wuxuu
xertiisii ku yidhi, U fadhiisiya koox koox konton konton ah.
15 Sidaasay yeeleen oo wada fadhiisiyeen. 16 Markaasuu
wuxuu qaaday shantii kibsood iyo labadii kalluun, oo intuu
cirka eegay, ayuu barakeeyey, oo kala jejebiyey, oo xertiisii
siiyey, inay dadkii badnaa hortooda dhigaan. 17 Markaasay
cuneen oo ka wada dhergeen; waxaana la guray jajabkii ka
hadhay oo laba iyo toban dambiilood ah. 18 Intuu keli ahaan
u tukanayay, ayaa xertiisii la joogtay, markaasuu weyddiiyey
isagoo leh, Dadkii badnaa yay igu sheegaan? 19 Way
u jawaabeen oo ku yidhaahdeen, Yooxanaa Baabtiisaha;
qaar kalena waxay yidhaahdeen, Eliyaas, qaarna waxay
yidhaahdeen, Nebi nebiyadii hore ah oo soo sara kacay. 20
Markaasuu wuxuu ku yidhi, Idinkuse yaad igu sheegtaan?
Butros ayaa u jawaabay oo wuxuu ku yidhi, Masiixii Ilaah. 21
Laakiin wuu waaniyey oo wuxuu ku amray inaanay ninna
waxaas u sheegin, 22 isagoo leh, Waxay waajib ugu tahay
Wiilka Aadanahu inuu wax badan ku xanuunsado, oo ay
waayeellada iyo wadaaddada sare iyo culimmadu diidaan, oo
la dilo, oo maalinta saddexaad la sara kiciyo. 23 Markaasuu
wuxuu kulligood ku yidhi, Mid uun hadduu doonayo inuu
iga daba yimaado, ha dayriyo doonistiisa, iskutallaabtiisana
maalin walba ha soo qaato oo ha i soo raaco. 24 Waayo,
kan doonaya inuu naftiisa badbaadiyo, waa lumin doonaa,
laakiin kan naftiisa u lumiya aawaday, kaasaa badbaadin
doona. 25 Waayo, nin maxay u taraysaa hadduu dunida
oo dhan helo oo uu islumiyo oo khasaaro? 26 Maxaa
yeelay, ku alla kii ka xishooda aniga iyo ereygaygaba, Wiilka
Aadanaha ayaa ka xishoon doona isaga, goortuu ku yimaado
ammaantiisa iyo ammaanta Aabbihiis iyo tan malaa'igaha
quduuska ah. 27 Laakiin run baan idiin sheegayaa, Kuwa
halkan taagan qaarkood sinaba dhimasho uma dhadhamin
doonaan ilaa ay arkaan boqortooyada Ilaah. 28 Abbaaraha
siddeed maalmood hadalladan dabadood waxaa dhacay
inuu waday Butros, iyo Yooxanaa, iyo Yacquub, oo buurtuu
fuulay inuu ku tukado, 29 oo intuu tukanayay, araggii
wejigiisa ayaa si kale noqday, dharkiisuna caddaan ayuu la
dhalaalayay. 30 Oo bal eeg, laba nin ayaa la hadlayay isaga,
waxayna ahaayeen Muuse iyo Eliyaas, 31 oo ammaan ku
soo muuqday, oo waxay kala hadlayeen dhimashadiisa uu
Yeruusaalem dhowaan ku dhammayn lahaa. 32 Laakiin
Butros iyo kuwii la jiray ayaa hurdo la cuslaaday; oo goortay
tooseen ayay arkeen ammaantiisa iyo labadii nin oo la
taagan. 33 Kolkay ka tegayeen waxaa dhacay in Butros
ku yidhi Ciise, Macallimow, waxaa inoo wanaagsan inaynu
halkan joogno, haddaba saddex waab aannu ka dhisno, mid
adaan ku dhisaynaa, midna Muuse, midna Eliyaas, waayo,
ma uu garanaynin wuxuu leeyahay. 34 Intuu waxaas lahaa,
waxaa timid daruur oo iyagay hadhaysay, wayna baqeen
kolkay daruurtii galeen. 35 Daruurtiina waxaa ka yimid cod
leh, Kanu waa Wiilkayga aan jeclahay ee maqla isaga. 36
Goortii codkii ahaaday Ciise keliya ayaa la arkay; markaasay
iska aamuseen, oo maalmahaas ninna uma ay sheegin wixii
ay arkeen. 37 Maalintii xigtay, goortay buurta ka soo degeen,
waxaa dhacay in dad badni la kulmay isaga. 38 Oo bal
eeg, nin dadkii badnaa ka mid ah ayaa qayliyey isagoo leh,
Macallimow, waxaan kaa baryayaa inaad wiilkayga eegto,
waayo, waa madigayga, 39 oo bal eeg, jinni baa qabsada,
oo dhaqsiba wiilkaa qayliya, jinniguna waa gilgilaa, oo wiilku
afkuu ka xumbeeyaa; dhib ayaa jinnigu kaga baxaa, isagoo
aad u burburinaya. 40 Waxaan xertaada ka baryay inay
ka saaraan, wayna kari waayeen. 41 Markaasaa Ciise u
jawaabay oo ku yidhi, Qarni yahow rumaysadka daranu oo
madaxa adagu, ilaa goormaan idinla jiri doonaa, oo ilaa
goormaan idiin dulqaadan doonaa? Wiilkaaga halkan keen.
42 Intuu weli soo socday, jinnigii ayaa jeexjeexay oo gilgilay.
Markaasaa Ciise jinnigii wasakhda lahaa canaantay, wiilkiina
ayuu bogsiiyey oo aabbihiis ku celiyey. 43 Kulli way ka
wada yaabeen Ilaah weynaantiisa. Laakiin intay kulligood la
wada yaabsanaayeen wixii uu sameeyey oo dhan, wuxuu
xertiisii ku yidhi, 44 Hadalladanu ha galeen dhegihiinna,
waayo, Wiilka Aadanaha ayaa dadka loo gacangelin doonaa.
45 Laakiin hadalkaas ayay garan waayeen, waana laga
qariyey si ayna u garan, wayna ka cabsadeen inay hadalkas
wax ka weyddiiyaan. 46 Waxaa ka dhex kacday dood ay
islahaayeen, Kee baa ahaan doonaa kan inoo weyn. 47
Laakiin Ciise markuu gartay fikirrada qalbigooda ayuu ilmo
qaaday oo is-ag joojiyey, 48 markaasuu ku yidhi iyaga, Ku

alla kii magacayga ku aqbala ilmahan, wuu i aqbalaa, oo
ku alla kii i aqbalaa, wuxuu aqbalaa kii i soo diray, waayo,
kii idiinku wada yar, kaas ayaa u weyn. **49** Yooxanaa baa
u jawaabay oo ku yidhi, Macallimow, waxaannu aragnay
qof magacaaga jinniyo ku saaraya, oo waannu u diidnay,
waayo, isagu nama uu soo raaco. **50** Laakiin Ciise wuxuu ku
yidhi, Ha u diidina, waayo, kan aan idinka gees ahayn waa
idinla gees. **51** Goortii wakhtigii isaga kor loo qaadi lahaa uu
dhowaaday, wuxuu wejigiisa u jeediyey inuu Yeruusaalem
tago. **52** Markaasuu hortiisa cid u diray, oo intay tageen ayay
galeen tuulo reer Samaariya ah inay wax u diyaariyaan isaga.
**53** Iyaguse ma ay dhowayn, waayo, wejigiisa ayaa u jeeday
xagga Yeruusaalem. **54** Markaasaa xertiisii Yacquub iyo
Yooxanaa goortay arkeen, waxay ku yidhaahdeen, Sayidow,
ma doonaysaa inaannu dab amarno inuu cirka ka soo dego
oo baabbi'iyo? **55** Isaguse waa ku jeestay oo canaantay
iyaga, oo ku yidhi, Garan maysaan caynkii ruuxa aad ka
tihiin. **56** Markaasay waxay aadeen tuulo kale. **57** Oo intay
jidka ku socdeen nin baa ku yidhi isaga, Waan ku raacayaa
meel alla meeshaad tagtidba. **58** Markaasaa Ciise wuxuu
ku yidhi, Dawacooyinku godad bay leeyihiin, shimbirraha
cirkuna buulal bay leeyihiin, laakiin Wiilka Aadanahu meel uu
madaxiisa dhigo ma leh. **59** Mid kalena ayuu ku yidhi, I soo
raac. Laakiin isagu wuxuu ku yidhi, Sayidow, horta ii oggolow
inaan tago oo aabbahay soo aaso. **60** Laakiin wuxuu ku
yidhi, Iska daa, meydadku ha aaseen meydadkooda, laakiin
adigu bax oo boqortooyadii Ilaah ku naadi. **61** Mid kale ayaa
yidhi, Sayidow, waan ku raacayaa, laakiin horta ii oggolow
inaan kuwa gurigayga jooga ku soo idhaahdo, Nabadgelyo.
**62** Ciise ayaa ku yidhi, Ma jiro nin gacantiisa mixaraatka
saara oo dib u eega, oo u qalma boqortooyada Ilaah.

**10** Waxaa dabadeed Rabbigu wuxuu soo bixiyey
toddobaatan kale, oo laba laba ayuu hortiisa u diray
ilaa magaalo walba iyo meel walba oo uu tegi lahaa. **2**
Wuxuuna ku yidhi, Waxa beerta laga gooynayaa way badan
yihiin, shaqaalayaashuse waa yar yihiin. Sidaa darteed
Sayidka beergooyska barya inuu shaqaalayaal beertiisa u
soo diro. **3** Socda, oo ogaada, waxaan idiin dirayaa sida
baraar oo yeey ku dhex jira. **4** Ha qaadanina kiish, ama
qandi, ama kabo, ninnaba jidka ha ku nabdaadinina. **5**
Guri alla gurigaad gashaan, horta waxaad ku tidhaahdaan,
Gurigan nabad ha u ahaato. **6** Ina nabdeed hadduu halkaas
joogo, nabaddiinnu waxay ahaan doontaa dushiisa, haddii
kalese way idinku soo noqon doontaa. **7** Gurigaas qudhiisa
jooga, idinkoo cunaya oo cabbaya waxay haystaan, waayo,
shaqaaluhu waa istaahilaa abaalgudkiisa. Guriba guri ha u
dhaafina. **8** Magaalo alla magaaladaad gashaan oo laydinka
soo dhoweeya, waxa laydin soo hor dhigo cuna. **9** Bogsiiya
kuwa buka oo halkaas jooga, oo ku dhaha, Boqortooyada
Ilaah waa idinku soo dhow dahay. **10** Laakiin magaalo alla
magaaladaad gashaan, oo aan laydinka soo dhowayn, u soo
baxa jidadkeeda, oo dhaha, **11** Xataa siigada magaaladiinna
ee cagahayaga soo raacday, waannu idinku tirtiraynaa,
laakiin kan ogaada, Boqortooyadii Ilaah waa dhow dahay.
**12** Waxaan idinku leeyahay, Maalintaas Sodom ayaa ka
xisaab fududaan doonta magaaldaas. **13** Waa kuu hoog,
Khorasinay. Waa kuu hoog, Beytsayday, waayo, shuqulladii
xoogga lahaa oo laydinku dhex sameeyey haddii Turos
iyo Siidoon lagu samayn lahaa, goor horay toobadkeeni
lahaayeen, iyagoo dhar joonyad ah gashan oo dambas ku
fadhiya. **14** Laakiin maalinta xisaabta Turos iyo Siidoon waa
idinka xisaab fududaan doonaan. **15** Adiguna Kafarna'umay,
samada ma laguu sarraysiin doonaa? Waxaa lagu dejin
doonaa Haadees. **(Hadēs g86)** **16** Kan idin maqlaa waa i
maqlaa, kan idin diidaana, waa i diidaa, kan i diidaana,
wuxuu diidaa kii i soo diray. **17** Toddobaatankii farxad
ayay la soo noqdeen, iyagoo leh, Sayidow, xataa jinniyadu
magacaaga ayay nooga dambeeyaan. **18** Markaasuu wuxuu
ku yidhi, Waxaan arkay Shayddaankoo sida hillaac samada
uga soo dhacaya. **19** Bal ogaada, waxaan idin siiyey amar
aad kula tumataan abeesooyin iyo dabaqalloocyo iyo xoogga
oo dhan ee cadowga; innaba waxba idinma yeeli doono. **20**
Laakiin tan ha ku farxina in jinniyadu ay idinka dambeeyaan,
laakiin ku farxa in magacyadiinnu ay jannada ku qoran yihiin.
**21** Saacaddaas qudheeda ayuu Ruuxa Quduuska ah ku
reyreeyey oo yidhi, Waan kugu mahadnaqayaa, Aabbow,
Rabbiga samada iyo dhulkow, waayo, waxyaalahan ayaad
kuwa caqliga iyo garashada leh ka qarisay, oo waxaad u
muujisay ilmo yaryar. Haah, Aabbow, waayo, sidaas ayaa
kaa farxisay. **22** Aabbahay wax walbaba waa ii dhiibay; oo
ninna Wiilka garan maayo cid uu yahay Aabbaha maahee, oo
ninna Aabbaha garan maayo cid uu yahay, Wiilka maahee,
iyo kii Wiilku doonayo inuu u muujiyo. **23** Wuxuuna u jeestay
xertiisa oo keli ahaan ugu yidhi, Waxaa barakaysan indhaha
arka waxaad aragtaan; **24** waayo, waxaan idinku leeyahay,
Nebiyo iyo boqorro badan ayaa doonay inay arkaan waxaad
aragtaan, mana arkin, iyo inay maqlaan waxaad maqashaan,
mana ay maqlin. **25** Mid sharciga yaqaan ayaa istaagay
oo jirrabay, isagoo leh, Macallimow, maxaan sameeyaa
si aan ku dhaxlo nolosha weligeed ah? **(aiōnios g166)** **26**
Wuxuu ku yidhi, Maxaa sharciga ku qoran? Sidee baad u
akhridaa? **27** Isagaa u jawaabay oo ku yidhi, Waa inaad
Rabbiga Ilaahaaga ah ka jeclaataa qalbigaaga oo dhan, iyo

naftaada oo dhan, iyo xooggaaga oo dhan, iyo caqligaaga
oo dhan, deriskaagana waa inaad u jeclaataa sida naftaada.
28 Wuxuu ku yidhi, Si hagaagsan ayaad u jawaabtay. Sidaas
yeel oo waad noolaan doontaa. 29 Laakiin isagoo doonaya
inuu iscaddeeyo inuu xaq yahay, ayuu Ciise ku yidhi, Yaa
deriskayga ah? 30 Ciise ayaa u jawaabay oo ku yidhi, Nin
baa Yeruusaalem ka soo degayay oo Yerixoo ku socday;
wuxuuna ku dhex dhacay tuugag, oo intay dharka ka furteen
oo garaaceen ayay ka tageen oo daayeen isagoo bestiis
ah. 31 Waxay noqotay in wadaad jidkaas ku soo degayay,
oo markuu arkay ayuu dhinaca kale maray. 32 Sidaas oo
kalena nin reer Laawi ah goortuu meeshaas yimid oo arkay,
ayuu dhinaca kale maray. 33 Laakiin nin reer Samaariya
ah intuu socday ayuu meeshiisa yimid, oo markuu arkay
ayuu u naxariistay. 34 Wuuna u dhowaaday, oo nabrihiisii ka
duudduubay, oo saliid iyo khamri ku shubay, markaasuu
saaray neefkiisii, oo hudheel geeyey, waana u dadaalay. 35
Maalintii dambe wuxuu soo bixiyey laba dinaar, oo siiyey
ninkii hudheelkii lahaa, oo ku yidhi, U dadaal, oo wixii
dambe oo kaaga baxa, soo noqodkayga ayaan kuu celin
doonaa. 36 Saddexdaas kee bay kula tahay inuu deris u
ahaa kii tuugagga ku dhex dhacay? 37 Wuxuu ku yidhi, Kii u
naxariistay. Markaasaa Ciise ku yidhi, Tag oo sidaas oo kale
yeel. 38 Intay socdeen wuxuu galay tuulo. Markaasaa qof
dumar ah oo Maarta la odhan jiray ayaa gurigeeda gelisay.
39 Waxayna lahayd walaal Maryan la odhan jiray, oo iyaduna
waxay ag fadhiisatay cagihii Sayidka oo ereygiisa maqashay.
40 Laakiin Maarta waxaa jiidanaysay hawl badan, oo intay u
timid ayay ku tidhi, Sayidow, miyaanay waxba kula ahayn
in walaashay i daysay inaan keligay adeego? Haddaba la
hadal inay ila qabato. 41 Laakiin Sayidku waa u jawaabay oo
ku yidhi, Maarta, Maartay, wax badan ayaad ka welwelaysaa
oo isku dhibaysaa. 42 Laakiin mid baa loo baahan yahay,
Maryanna waxay dooratay intii roonayd oo aan laga qaadi
doonin.

**11** Meel buu ku tukanayay, oo goortuu dhammeeyey, mid
xertiisa ka mid ah ayaa ku yidhi, Sayidow, na bar si loo
tukado, sida Yooxanaa xertiisa u baray. 2 Wuxuu ku yidhi,
Goortaad tukanaysaan dhaha, Aabbahayaga jannada ku
jirow, magacaagu quduus ha ahaado, boqortooyadaadu ha
timaado. 3 Maalinba maalin kibistayada nagu filan na sii. 4 Oo
naga cafi dembiyadayada, waayo, annaguba waa u cafinnaa
mid walba oo aannu qaan ku leennahay, oo jirrabaaddana
ha noo kaxayn. 5 Wuxuuna ku yidhi, Kiinnee baa saaxiib
leh oo saqdadhexe u tegaya oo ku odhanaya, Saaxiibow,
saddex kibsood i amaahi, 6 waayo, saaxiibkay ayaa safar
iiga yimid, oo waxaan hor dhigo ma hayo. 7 Kaasaana
gudaha ka jawaabaya oo odhanaya, Ha i dhibin. Albaabka
waa la xidhay; carruurtayduna sariirtay ila jiiftaa; umana
kici karo inaan wax ku siiyo. 8 Waxaan idinku leeyahay, In
kastoo aanu kici doonin oo aanu siin doonin saaxiibnimadiisa
aawadeed, weliba baryo badnaantiisa aawadeed ayuu u
kici doonaa oo u siin doonaa in alla intuu u baahan yahay.
9 Waxaan idinku leeyahay, Weyddiista oo waa laydin siin
doonaa; doona oo waad heli doontaan; garaaca oo waa
laydinka furi doonaa. 10 Waayo, mid kasta oo weyddiista waa
la siiyaa; kii doonaana waa helaa; kii garaacana waa laga furi
doonaa. 11 Midkiinnee baa oo aabbe ah haddii wiilkiisu kibis
weyddiisto, dhagax siinaya? Ama hadduu kalluun weyddiisto,
kalluunka meeshiis abeeso siinaya? 12 Ama hadduu ukun
weyddiisto, dabaqallooc siinaya? 13 Haddaba idinka oo
shar leh haddaad garanaysaan inaad hadiyado wanaagsan
carruurtiinna siisaan, intee ka badan ayaa Aabbihiinna
jannada ku jiraa Ruuxa Quduuska ah uu siin doonaa kuwa
isaga weyddiista? 14 Wuxuu saarayay jinni carrab la'.
Waxaana dhacay goortuu jinnigii baxay inuu kii carrabka
la'aa hadlay, dadkiina way yaabeen. 15 Laakiin qaarkood
ayaa yidhi, wuxuu jinniyada ku saaraa Be'elsebul oo ah
madaxda jinniyada. 16 Markaasaa kuwa kale oo jirrabaya
waxay ka doonayeen inuu calaamo cirka ka tuso. 17 Laakiin
isagoo garanaya fikirradooda ayuu ku yidhi, Boqortooyo
walba oo kala qaybsantaa, cidla' bay noqotaa, guri guri
ka qaybsamaana waa dumaa. 18 Shayddaankuna hadduu
kala qaybsamo, boqortooyadiisu sidee bay u taagnaan
doontaa? Waayo, waxaad tidhaahdaan, Waxaad jinniyo ku
saartaa Be'elsebul. 19 Anigu haddii aan jinniyada ku saaro
Be'elsebul, wiilashiinna yay ku saaraan? Sidaa darteed iyagu
waxay ahaanayaan xaakinnadiinna. 20 Laakiin haddaan
jinniyada ku saaro farta Ilaah, waxaa idiin timid boqortooyada
Ilaah. 21 Nin xoog leh oo hubaysan markuu ilaalinayo
barxaddiisa, alaabtiisu waa nabad gelaysaa. 22 Laakiin mid
ka xoog badan goortuu ku soo baxo oo ka adkaado, wuxuu
ka qaadaa hubkiisii uu isku halleeyey, oo wuu qaybiyaa
wuxuu ka dhacay. 23 Kan aan ila jirin waa iga gees, oo
kan aan ila ururin waa firdhiyaa. 24 Jinniga wasakhda leh
goortuu ninka ka baxo, wuxuu maraa meelo aan biyo lahayn,
isagoo nasasho doonaya, oo markuu heli waayo, wuxuu
yidhaahdaa, Waxaan ku noqonayaa gurigaygii aan ka baxay.
25 Oo goortuu yimaado wuxuu helaa isagoo xaaqan oo
hagaagsan. 26 Markaasuu tagaa oo wuxuu wataa toddoba
jinni oo kale oo ka xunxun isaga, wayna galaan oo halkaas
joogaan. Ninkaas wakhtigiisa dambe ayaa ka darnaada
wakhtiga hore. 27 Waxaa dhacay goortuu waxyaalahaas

yidhi, in qof dumar ah oo dadka ka mid ah codkeeda kor u
qaadday oo ku tidhi, Waxaa barakaysan uurka ku siday iyo
naasihii aad nuugtay. 28 Laakiin wuxuu ku yidhi, Runtaa,
laakiin waxaa barakaysan kuwa ereyga Ilaah maqla oo
xajiya. 29 Goortii dadkii badnaa isugu soo ururayeen, wuxuu
bilaabay inuu yidhaahdo, Qarniganu waa qarni shareed;
calaamo bay doonayaan, lamana siin doono, calaamada
Yoonis maahee. 30 Waayo, sida Yoonis calaamo ugu noqday
reer Nineweh, sidaas oo kale ayuu Wiilka Aadanahu calaamo
ugu ahaan doonaa qarnigan. 31 Boqoradda koonfureed
waxay xisaabta la kici doontaa dadka qarnigan, wayna
xukumi doontaa, waayo, waxay ka timid meesha dhulka ugu
shishaysa inay xigmadda Sulaymaan maqasho, oo bal eeg,
mid Sulaymaan ka weyn ayaa halkan jooga. 32 Nimanka
Nineweh waxay xisaabta isla taagi doonaan dadka qarnigan,
wayna xukumi doonaan, waayo, waxay ku toobadkeeneen
wacdigii Yoonis, oo bal eeg, mid Yoonis ka weyn ayaa
halkan jooga. 33 Ma jiro nin, goortuu ilays shido, dhiga meel
qarsoon ama weel hoostiisa, laakiin wuxuu saaraa meeshii
ilayska si ay kuwa soo galaa iftiinka u arkaan. 34 Ilayska
jidhkaagu waa ishaada, ishaaduna markay hagaagsan tahay,
jidhkaaga oo dhammu waa iftiimaa, laakiin goortay xun
tahay, jidhkaaguna waa gudcur. 35 Haddaba iska jir si
iftiinka kugu jiraa aanu gudcur u ahaan. 36 Haddaba haddii
jidhkaaga oo dhammu iftiimo, aanuna lahayn meel gudcur
ah, waa wada iftiimaa, sida goortii ilayska dhalaalayaa
uu kuu iftiimiyo. 37 Goortuu hadlayay, nin Farrisi ah ayaa
weyddiistay inuu wax la cuno; wuuna galay gurigiisa, oo
cunto u fadhiistay. 38 Farrisigii markuu arkay waa yaabay,
waayo, cuntada horteed ma uu faraxalan. 39 Sayidka ayaa
ku yidhi, Haddeer idinkoo Farrisiin ah waxaad dusha ka
nadiifisaan koobka iyo xeedhada, laakiin xaggiinna hoose
waxaa ka buuxa dulun iyo shar. 40 Doqonno yahow, kii
dusha sameeyey miyaanu gudahana samaynin? 41 Laakiin
waxa gudaha ah sadaqad u bixiya, oo bal eeg, wax walba
waa idiin nadiifsan yihiin. 42 Laakiin waa idiin hoog, Farrisiin
yahay, waayo, reexaanta iyo kabsarta iyo khodaarta oo
dhan toban meelood ayaad meel ka bixisaan, oo waxaad
dhaaftaan xukunka iyo jeclaanta Ilaah. Waxaad lahaydeen
inaad waxan samaysaan oo aydnaan kuwa kale dhaafin. 43
Waa idiin hoog, Farrisiin yahay, waayo, waxaad jeceshihiin
kursiyada hore oo sunagogyada, iyo salaanta suuqa. 44
Waa idiin hoog, waayo, waxaad tihiin sida xabaalo aan
muuqanaynin; nimanka dul marayaana aanay garanaynin. 45
Kuwa sharciga yaqaan midkood ayaa u jawaabay oo ku yidhi,
Macallimow, markaad waxaas leedahay, annagana waad na
caayaysaa. 46 Markaasuu ku yidhi, Idinkana waa idiin hoog,
sharciga sheegayaal yahow, waayo, waxaad nimanka ku
rartaan wax culus oo qaadiddoodu dhib leedahay; idinkuse
farihiinna middood kuma taabataan culaabta. 47 Waa
idiin hoog, waayo, waxaad dhistaan xabaalaha nebiyada,
awowayaashiinse way dileen. 48 Haddaba waxaad tihiin
markhaatiyaal oo aad oggoshihiin shuqulkii awowayaashiin,
waayo, iyagaa dilay, idinkuna waad dhistaan xabaalahooda.
49 Sidaa darteed xigmadda Ilaah ayaa tidhi, Waxaan u diri
doonaa nebiyo iyo rasuullo; qaarkood waa la dili doonaa oo
la silcin doonaa, 50 in qarnigan la weyddiiyo dhiiggii nebiyada
oo dhan oo daatay tan iyo aasaaskii dunida, 51 oo laga
bilaabo dhiiggii Haabiil ilaa dhiiggii Sakariyas kii ku dhintay
meeshii allabariga iyo meesha quduuska ah dhexdooda.
Runtii, waxaan idinku leeyahay, Qarnigan ayaa la weyddiin
doonaa. 52 Waa idiin hoog, sharciga sheegayaal yahow,
waayo, furihii garashada ayaad qaaddeen. Idinka qudhiinnu
ma gelin, oo kuwii gelayayna ayaad ka hor joogsateen. 53
Oo kolkuu meeshaas ka baxay, culimmada iyo Farrisiintu
waxay bilaabeen inay aad ugu dhirfaan iyo inay wax badan
kaga hadlisiiyaan, 54 iyagoo gaadaya inay ku qabtaan wixii
afkiisa ka soo baxa.

**12** Markii dadkii badnaa oo tirola'aanta ahaa isa soo
tubeen, ilaa ay qaarba qaar ku joogjoogsadeen, wuxuu
bilaabay inuu kolkii hore xertiisa ku yidhaahdo, Iska jira
khamiirka Farrisiinta kan ah labawejiilenimada. 2 Ma jiro wax
daboolan oo aan soo muuqan doonin ama wax qarsoon
oo aan la garan doonin. 3 Sidaa darteed wax kasta oo
aad gudcurka ku dhex tidhaahdeen, iftiinka ayaa laga
maqli doonaa, oo wixii aad dhegta iskagala hadasheen
qoolal qarsoon ayaa guryaha dushooda lagaga dhawaaqi
doonaa. 4 Waxaan idinku leeyahay, saaxiibbadayow, Ha ka
baqina kuwa jidhka dila, oo aan dabadeed wax kale samayn
karin. 5 Laakiin waxaan idinkaga digayaa kaad ka baqi
lahaydeen. Ka baqa kan kolkuu dilo dabadeed amar u leh
inuu jahannamada ku tuuro. Runtii, waxaan idinku leeyahay,
Kaas ka baqa. **(Geenna g1067)** 6 Shan shimbirrood miyaan
laba beesadood lagu iibin? Oo midna lagama illaawin Ilaah
hortiisa. 7 Laakiin timaha madaxiinna oo dhan waa tirsan
yihiin. Ha baqina; waad ka qiima badan tihiin shimbirro
badan. 8 Weliba waxaan idinku leeyahay, Mid walba oo igu
qirta dadka hortiisa, ayaa Wiilka Aadanahu ku qiran doonaa
malaa'igaha Ilaah hortooda. 9 Laakiin kii igu diida dadka
hortiisa, malaa'igaha Ilaah hortooda ayaa lagu diidi doonaa,
10 oo mid walba oo ku hadla hadal Wiilka Aadanaha ka
gees ah, waa loo cafiyi doonaa, laakiin kii caaya Ruuxa
Quduuska ah looma cafiyi doono. 11 Goortay idin hor

keenayaan sunagogyada, iyo taliyayaasha, iyo kuwa amarka
leh, ha ka welwelina sidii iyo wixii aad ku jawaabi doontaan
ama waxaad odhan doontaan, **12** waayo, Ruuxa Quduuska
ah ayaa saacaddaas idin bari doonaa wixii aad leedihiin
inaad tidhaahdaan. **13** Oo mid dadka ka mid ah ayaa ku
yidhi, Macallimow, walaalkay u sheeg inuu dhaxalka ila
qaybsado. **14** Laakiin wuxuu ku yidhi, Ninkow, yaa iiga kiin
dhigay xukume ama qaybiye? **15** Wuxuu iyaga ku yidhi,
Fiiriya oo iska ilaaliya damacnimada oo dhan, waayo, qof
goortuu maal badnaado, noloshiisu kama timaado maalkuu
leeyahay. **16** Markaasuu masaal kula hadlay oo ku yidhi, Nin
hodan ah dhulkiisa ayaa wax badan bixiyey. **17** Kolkaasuu
isla tashaday isagoo leh, Maxaan sameeyaa, waayo, ma
haysto meel aan ku ururiyo wixii ii baxay? **18** Markaasuu
yidhi, Sidan ayaan samayn doonaa. Maqsinnadaydii ayaan
dumin doonaa oo kuwa ka waaweyn ayaan dhisan doonaa;
halkaasna ayaan ku urursan doonaa sarreenkayga iyo
alaabtayda oo dhan, **19** oo waxaan naftayda ku odhan
doonaa, Nafay, waxaad leedahay alaab badan oo sannado
badan loo dhigay. Naso oo wax cun oo cab oo farax.
**20** Laakiin Ilaah wuxuu ku yidhi, Kaaga doqonka ahow,
caawa naftaada waa lagu weyddiisan doonaa, wixii aad
diyaarsatayna yaa lahaan doonaa? **21** Sidaas oo kale
weeye kan maal urursada oo aan Ilaah u hodan ahayn. **22**
Markaasuu xertiisii ku yidhi, Sidaa darteed waxaan idinku
leeyahay, Ha ugu welwelina naftiinna waxaad cuni doontaan,
jidhkiinnana waxaad huwin doontaan. **23** Waayo, naftu waa
ka roon tahay cuntada, jidhkuna waa ka roon yahay dharka.
**24** Tukayaasha fiiriya, waayo, waxba ma beeraan, waxna
ma gurtaan, mana haystaan maqsin ama meel ay wax ku
urursadaan, oo Ilaah baa cunto siiya. Intee baad ka roon
tihiin shimbirraha! **25** Midkiinee intuu welwelo, dhererkiisa
dhudhun ku dari kara? **26** Haddaba haddii aanad samayn
karin xataa waxa u yar, maxaad ugu welweshaan intii kale?
**27** Fiiriya ubaxyada, siday u baxaan, ma ay shaqeeyaan,
ma ayna miiqdaan. Weliba waxaan idinku leeyahay, Xataa
Sulaymaan wakhtiga ammaantiisii oo dhan dhar uma uu
gashan jirin sida kuwan midkood. **28** Laakiin haddii Ilaah
sidaa u huwiyo cawska maanta duurka ku yaal oo berrito
moofada lagu ridayo, sidee ka badan ayuu idiin huwinayaa,
rumaysad yarayaalow? **29** Ha doondoonina waxaad cuntaan
iyo waxaad cabtaan, oo ha shakiyina, **30** waayo, quruumaha
dunidu waxaas oo dhan ayay doondoonaan; laakiin Aabbihiin
waa og yahay inaad waxaas u baahan tihiin. **31** Laakiin
doondoona boqortooyadiisa, oo waxaas oo dhan waa
laydiinku dari doonaa. **32** Ha baqina, idoyahow yari, waayo,
Aabbihiin waxaa ka farxiya inuu boqortooyada idin siiyo.
**33** Iibiya waxaad leedihiin oo sadaqo bixiya. Samaysta
kiishash aan duugoobaynin, oo maal aan dhammaanaynin
ku urursada jannada, meesha aan tuug ku soo dhowaan oo
aan aboor ku baabbi'in. **34** Waayo, meesha maalkiinnu ku
jiro, meeshaasaa qalbigiinnuna ku jiri doonaa. **35** Dhexdiinnu
ha xidhnaato, laambadihiinnuna ha baxaan. **36** Idinkuna
ahaada sida niman sayidkooda sugaya, goortuu arooska
ka soo noqdo, inay markiiba ka furaan markuu yimaado
oo garaaco. **37** Waxaa barakaysan addoommadaas, kuwa
sayidku goortuu yimaado, uu helo iyagoo soo jeeda. Runtii
waxaan idinku leeyahay, Isagu waa guntan doonaa, oo cunto
ayuu u fadhiisan doonaa, oo intuu iyaga u dhowaado ayuu
u adeegi doonaa. **38** Hadduu yimaado wakhtigii gaadhka
labaad ama kan saddexaad oo uu helo iyagoo sidaas ah,
kuwaas ayaa barakaysan. **39** Laakiin tan ogaada, odayga
reerku hadduu ogaan lahaa saacadda tuuggu imanayo,
wuu soo jeedi lahaa, oo uma uu daayeen in gurigiisa la
jebiyo. **40** Idinkuna diyaar ahaada, waayo, saacad aydnaan
u malaynaynin ayaa Wiilka Aadanahu imanayaa. **41** Butros
ayaa ku yidhi, Sayidow, ma annaga ayaad masaalkan nagula
hadlaysaa ama dadka oo dhan? **42** Sayidkuna wuxuu yidhi,
Haddaba yuu yahay wakiilka aaminka ah oo caqliga leh,
kan uu sayidkiisu u sarraysiin doona dadka gurigiisa, inuu
qaybtooda oo cuntada ah siiyo wakhtigeeda? **43** Waxaa
barakaysan addoonkaas kan sayidkiisu goortuu yimaado
uu helayo isagoo sidaas samaynaya. **44** Runtii waxaan
idinku leeyahay. Wuxuu leeyahay oo dhan ayuu ka sarraysiin
doonaa isaga. **45** Laakiin haddii addoonkaas qalbigiisa
ka yidhaahdo, Sayidkayga imaatinkiisii waa raagay, oo
uu bilaabo inuu garaaco midiidinyada ragga iyo dumarka
ahaa, iyo inuu wax cuno oo wax cabbo oo sakhraamo, **46**
addoonkaas sayidkiisu wuxuu iman doonaa maalin aanu
filayn oo saacad aanu ogayn, oo waa kala jeexi doonaa, oo
wuxuu ka dhigi doonaa mid qayb la hela kuwa aan aaminka
ahayn. **47** Addoonkaas ogaa doonista sayidkiisa, oo aan
diyaargarayn, oo aan yeelin sidii doonistiisu ahayd, wax
badan waa la garaaci doonaa. **48** Laakiin kii aan ogayn oo
yeelayse wixii garaacid istaahila, wax yar baa la garaaci
doonaa. Mid kasta oo wax badan la siiyey, wax badan
ayaa laga dooni doonaa, oo kan wax badan loo sii dhiibtay,
wax ka badan ayaa la weyddiisan doonaa. **49** Waxaan
u imid inaan dab dhulka ku tuuro, oo maxaan doonayaa
hadduu durba shidan yahay? **50** Anigu waxaan leeyahay
baabtiis in laygu baabtiisayo oo sidee lay cidhiidhiyey ilaa
uu dhammaado! **51** Miyaad u malaynaysaan inaan u imid
inaan nabad dhulka siiyo? Waxaan idinku leeyahay, Maya,
laakiinse kalasoocid. **52** Waayo, intii haddeer ka dambaysa

waxaa guri ku jiri doona shan kala soocan, saddex laba
ka gees ah iyo laba saddex ka gees ah. 53 Waa kala
soocmayaan, aabbe wiil ka gees ah iyo wiil aabbe ka gees
ah, hooyo gabadh ka gees ah iyo gabadh hooyadeed ka
gees ah, soddoh afadii wiilkeeda ka gees ah iyo afadii
wiilkii soddohdeed ka gees ah. 54 Weliba wuxuu dadkii
badnaa ku yidhi, Goortaad aragtaan daruur gabbaldhac ka
soo baxaysa, kolkiiba waxaad tidhaahdaan, Roob baa soo
socda, oo sidaasuu noqdaa. 55 Oo goortaad aragtaan dabayl
koonfureed oo dhacaysa waxaad tidhaahdaan, Kulaylku
waa iman doonaa, waana noqda. 56 Labawejiilayaal yahow,
waxaad kala garanaysaan muuqashada dhulka iyo cirka,
laakiin wakhtigan sidee baad u kala garan weydaan? 57
Maxaad qudhiinnu waxa xaqa ah u xukumi weydaan? 58
Goortaad cadowgaaga u raacdo xaakinka, intaad jidka
maraysaan ku dadaal si aad uga baxsato, inaanu xaakinka
kuu jiidin, xaakinkuna askariga kuu dhiibin, askariguna
xabsiga kugu tuurin. 59 Waxaan kugu leeyahay, Halkaas
ka soo bixi maysid ilaa aad siisid lacagta u yar oo ugu
dambaysa.

**13** Wakhtigaas qudhiisa waxaa joogay qaar wax uga
sheegay dadka reer Galili oo Bilaatos dhiiggooda ku
daray allabarigooda. 2 Kolkaasaa Ciise u jawaabay oo
wuxuu ku yidhi, Ma waxay idinla tahay in kuwii reer Galili
ahaa ay ka dembi badnaayeen kuwii kale oo reer Galili oo
dhan waxyaalahaas ay ku silceen aawadood? 3 Waxaan
idinku leeyahay, Maya, laakiin haddaanad toobadkeenin,
kulligiin sidaas oo kale ayaad u lumi doontaan. 4 Ama
siddeed iyo tobankii oo munaaradda Siloo'am ay ku soo
dhacday oo ay dishay, ma waxay idinla tahay, inay ka gef
badnaayeen dadka Yeruusaalem joogay oo dhan? 5 Waxaan
idinku leeyahay, Maya, laakiin haddaydnan toobadkeenin,
kulligiin sidaas oo kale ayaad u lumi doontaan. 6 Markaasuu
masaalkan ku hadlay, Nin baa wuxuu lahaa geed berde
ah oo beertiisii canabka ahayd lagu beeray. Waa u yimid
isagoo midho ka doonaya, waxbana kama uu helin. 7 Wuxuu
beer-ka-shaqeeyihii ku yidhi, Bal eeg, saddex sannadood
ayaan imanayay oo berdahan midho ka doonayay, kamana
helin. Jar, muxuu dhulka u khasaarinayaa? 8 Markaasuu
u jawaabay oo wuxuu ku yidhi, Sayidow, sannaddanna
daa ilaa aan hareerihiisa qodqodo oo aan digeeyo. 9
Dabadeed hadduu midhaysto, wanaag; haddii kalese waad
jari doontaa. 10 Maalin sabti ah sunagogyada midkood
ayuu wax ku barayay. 11 Oo bal eeg, waxaa joogtay naag
siddeed iyo toban sannadood cudur qabtay, wayna isku
soo jabnayd, mana ay kari karin inay istoosiso. 12 Ciise
goortuu arkay, ayuu u yeedhay oo ku yidhi, Haweentoy,
cudurkaaga waad ka furan tahay. 13 Kolkaasuu gacmihiisa
saaray, oo kolkiiba way toosnaatay, oo Ilaah bay ammaantay.
14 Kii sunagogga u sarreeyey ayaa cadho ku jawaabay,
waayo, Ciise maalintii sabtida ahayd ayuu wax bogsiiyey,
wuxuuna dadkii badnaa ku yidhi, Waxaa jira lix maalmood
oo dadkii leeyihiin inay shaqeeyaan. Maalmahaas haddaba
kaalaya, ha laydin bogsiiye, ee ha imanina maalinta sabtida
ah. 15 Laakiin Sayidka ayaa u jawaabay oo ku yidhi,
Labawejiilayaal yahow, mid kasta oo idinka mid ah miyaanu
sabtida dibigiisa ama dameerkiisa ka soo furin golaha
oo u wadin inuu soo waraabiyo? 16 Oo naagtan oo ina
Ibraahim ah oo Shayddaanku siddeed iyo toban sannadood
xidhay, miyaanay lahayn in maalinta sabtida ah laga fura
xidhmaddaas? 17 Goortuu waxaas yidhi cadaawayaashiisii
oo dhan way wada ceeboobeen, dadkii oo dhanna ayaa ku
reyreeyey wax walba oo ammaanta lahaa oo uu falay. 18
Haddaba wuxuu yidhi, Boqortooyada Ilaah maxay u eg tahay
oo maxaan u ekaysiiyaa? 19 Waxay u eg tahay iniin khardal
ah, oo nin qaaday oo beertiisii ku riday, oo ay baxday oo geed
dheer noqotay, shimbirraha cirkuna laamaheeday ku degeen.
20 Haddana wuxuu yidhi, Maxaan boqortooyada Ilaah u
ekaysiiyaa? 21 Waxay u eg tahay khamiir naag intay qaadday
ay saddex qiyaasood oo bur ah ku dhex qooshtay ilaa ay
wada khamiireen. 22 Oo wuxuu dhex marayay magaalooyin
iyo tuulooyin isagoo wax baraya, Yeruusaalemna ayuu
ku socday. 23 Mid baa wuxuu ku yidhi, Sayidow, ma yar
yihiin kuwa badbaadayaa? 24 Wuxuuna ku yidhi, Aad u
dadaala inaad iridda cidhiidhsan ka gashaan, waayo, waxaan
idinku leeyahay, Qaar badan ayaa dooni doona inay galaan,
mana kari doonaan. 25 Goortii ninkii guriga lahaa kaco oo
albaabka xidho, oo aad bilowdaan inaad dibadda istaagtaan
oo aad albaabka garaacdaan, idinkoo leh, Sayidow, naga
fur; isaguna waa u jawaabi doonaa oo idinku odhan doonaa,
Garan maayo meeshaad ka timaadeen. 26 Markaasaad
bilaabi doontaan inaad tidhaahdaan, Hortaada ayaannu wax
ku cuni jirnay oo ku cabbi jirnay, oo jidadkayaga ayaad wax
ku bari jirtay. 27 Markaasuu odhan doonaa, Waxaan idinku
leeyahay, Garan maayo meeshaad ka timaadeen; iga taga
kulligiin oo xaqdarrada ka shaqeeya. 28 Halkaa waxaa jiri
doonta baroor iyo ilko jirriqsi goortaad boqortooyada Ilaah
ku aragtaan Ibraahim iyo Isxaaq iyo Yacquub iyo nebiyada
oo dhan, oo idinkana dibadda laydiin tuuray. 29 Waxay ka
iman doonaan bari iyo galbeed iyo woqooyi iyo koonfur,
waxayna dhex fadhiisan doonaan boqortooyada Ilaah. 30
Ogaada, kuwa ugu dambeeya ayaa ugu horrayn doona,
kuwa ugu horreeyaana way ugu dambayn doonaan. 31

Markaas qudhiisa ayaa waxaa yimid qaar Farrisiin ah iyagoo ku leh, Bax oo ka tag meeshan, waayo, Herodos ayaa doonaya inuu ku dilo. **32** Wuxuu iyaga ku yidhi, Idinku u taga oo dawacaas u sheega, Bal eeg, maanta iyo berriba ayaan jinniyo saarayaa oo dad bogsiinayaa, maalinta saddexaadna ayaan kaamilmayaa. **33** Laakiin waa inaan socdo maanta iyo berri iyo maalinta ku xigtaba, waayo, ma noqon karto nebi inuu ku dhinto Yeruusaalem dibaddeeda. **34** Yeruusaalemay, Yeruusaalemay, tan nebiyada dishoy, oo kuwa loo soo diray dhagxisoy! Intee baan marar badan jeclaaday inaan carruurtaada u soo ururiyo xataa sida dooradu carruurteeda baalasheeda hoostooda ugu ururiso, laakiin idinku ma aydnaan jeclayn. **35** Ogaada, gurigiinnii waa laydiin daayay, isagoo cidla ah. Waxaan idinku leeyahay, Ima arki doontaan ilaa aad tidhaahdaan, Waxaa barakaysan kan Rabbiga magiciisa ku imanaya.

**14** Maalin sabti ah markuu galay mid ka mid ah kuwa Farrisiinta u sarreeya gurigiisa inuu kibis cuno, waxaa dhacay inay fiirinayeen. **2** Oo bal eeg, waxaa hortiisa joogay nin uurweynaad qaba. **3** Markaasaa Ciise u jawaabay oo kuwii sharciga yiqiin iyo Farrisiintii ku yidhi, isagoo leh, Ma xalaal baa in sabtida wax la bogsiiyo, mise maya? **4** Laakiin way aamuseen. Isaguse, intuu ninkii qabtay, ayuu bogsiiyey, markaasuu sii daayay. **5** Wuxuu iyaga ku yidhi, Kiinnee baa leh dameer ama dibi ceel ku dhacay oo aan maalin sabti ah dhaqso uga soo bixinaynin? **6** Wayna uga jawaabi kari waayeen waxyaalahaas. **7** Goortuu arkay kuwii loo yeedhay siday kursiyada hore u doorteen, ayuu masaal kula hadlay oo ku yidhi, **8** Markii nin kuugu yeedho aroos, kursiga hore ha fadhiisan, waaba intaasoo isagu nin kaa murwad weyn ugu yeedho, **9** oo kii isaga iyo adiga idiin yeedhay uu yimaado oo kugu yidhaahdo, Kan meel sii, oo markaasaad bilaabaysaa inaad meesha dambe ceeb ku fadhiisato. **10** Laakiin goortii laguu yeedho, tag oo meesha u hoosaysa fadhiiso, si kii kuu yeedhay kolkuu yimaado uu kuugu yidhaahdo, Saaxiibow, sare u soco. Markaasaad ammaan ku lahaan doontaa kuwa cuntada kula fadhiya oo dhan hortooda. **11** Waayo, mid kasta oo isa sarraysiiya waa la hoosaysiin doonaa; oo kii is-hoosaysiiyana waa la sarraysiin doonaa. **12** Wuxuuna ku yidhi kii u yeedhay, Goortaad qado ama casho samayso, ha u yeedhin saaxiibbadaada ama walaalahaa ama xigaalkaa ama derisyadaada hodanka ah, waaba intaasoo iyaguna ay markooda kuu yeedhaan, oo ay abaalgud kugu noqotaa. **13** Laakiin goortaad diyaafad samayso waxaad u yeedhaa masaakiinta iyo kuwa laxaadka la' iyo curyaannada iyo indhoolayaasha, **14** oo aad barakaysnaan doontaa, waayo, iyagu maleh waxa ay kuugu abaalgudaan, laakiin waxaa laguu abaalgudi doonaa wakhtiga sarakicidda kuwa xaqa ah. **15** Kuwa cuntada ula fadhiyey midkood, goortuu waxaas maqlay, wuxuu isaga ku yidhi, Waxaa barakaysan kan kibis ku cuni doona boqortooyada Ilaah. **16** Wuxuuse ku yidhi, Nin baa casho weyn sameeyey, oo dad badan u yeedhay, **17** oo saacaddii cashada ayuu addoonkiisii u diray inuu kuwii loo yeedhay ku yidhaahdo, Kaalaya, waayo, haatan wax waluba waa diyaar. **18** Markaasay kulligood waxay bilaabeen inay fikir keliya ku marmarsiiyoodaan. Kii u horreeyey ayaa ku yidhi, Beer baan iibsaday, oo waa inaan tago oo aan soo arko. Waxaan kaa baryayaa inaad iga raalli ahaato. **19** Mid kale ayaa yidhi, Waxaan iibsaday shan qindi oo dibi ah, oo waan tegayaa inaan imtixaamo. Waxaan kaa baryayaa inaad iga raalli ahaato. **20** Mid kale ayaa yidhi, Naag baan guursaday, sidaa darteed ma iman karo. **21** Markaasaa addoonkii yimid, oo waxaas ayuu sayidkiisii u sheegay. Kolkaasaa sayidkii gurigu cadhooday, oo wuxuu addoonkiisii ku yidhi, Dhaqso jidadka iyo surimmada magaalada u bax oo soo kaxee masaakiinta iyo kuwa laxaadka la' iyo indhoolayaasha iyo curyaannada. **22** Kolkaasaa addoonkii ku yidhi, Sayidow, waxaad amartay waa la yeelay, oo weli meel baa bannaan. **23** Markaasaa sayidkii wuxuu addoonkii ku yidhi, Jidadka iyo wadiiqooyinka oodaha u bax, oo dadka ku qasab inay soo galaan, si uu gurigaygu u buuxsamo. **24** Waayo, waxaan idinku leeyahay, Nimankaas loo yeedhay midkoodna cashadayda dhadhamin maayo. **25** Waxaa isaga la socday dad badan. Markaasuu u jeestay, oo wuxuu ku yidhi, **26** Haddii qof ii yimaado oo aanu nicin aabbihiis iyo hooyadiis iyo afadiisa iyo carruurtiisa iyo walaalihiis, xataa naftiisana xer iima ahaan karo. **27** Ku alla kii aan iskutallaabtiisa soo qaadan oo aan iga daba iman, xer iima ahaan karo. **28** Waayo, midkiinnee doonaya inuu noobiyad dhiso oo aan kolkii hore fadhiisan inuu xisaabo intay ku kacayso, inuu ogaado inuu haysto wax uu ku dhammeeyo iyo in kale? **29** Waaba intaasoo markuu aasaaska dhigo oo uu dhammayn kari waayo, kuwa eegaya oo dhammu ay bilaabaan inay ku qoslaan, **30** iyagoo leh, Ninkanu wuxuu bilaabay inuu wax dhiso, waana dhammayn kari waayay. **31** Ama boqorkee u tegaya inuu boqor kale dagaal u baxo, isagoo aan kolkii hore fadhiisan oo tashan inuu toban kun kala hor tegi karo kan labaatan kun ula imanaya? **32** Ama haddii kale intuu kan kale weli fog yahay, ayuu ergo soo diraa oo uu weyddiistaa wax lagu heshiiyo. **33** Sidaa darteed midkiin walba oo aan ka tegin wuxuu leeyahay oo dhan, xer iima ahaan karo. **34** Haddaba cusbadu waa wanaagsan tahay, laakiin haddii cusbadu dhadhan beesho, maxaa lagu

cusbaynayaa? 35 Uma ay wanaagsana dhulka ama meeshii
digada, waase la tuuraa. Kan dhego wax lagu maqlo lahu,
ha maqlo.

15 Waxaa Ciise u soo dhowaanayay cashuurqaadayaasha
iyo dembilayaasha oo dhan inay maqlaan. 2 Kolkaasay
Farrisiintii iyo culimmadiiba gunuunaceen, iyagoo leh,
Ninkanu dembilayaashuu soo dhoweeyaa oo wax la cunaa. 3
Markaasuu masaalkan kula hadlay, oo ku yidhi, 4 Ninkiinnee
baa tiro ido ah leh, oo middood ka hallowday, aan sagaal
iyo sagaashanka cidlada kaga tegin, oo aan tii hallowday
ka daba tegin, ilaa uu soo helo? 5 Oo goortuu soo helo,
aan garbihiisa saarin, isagoo faraxsan. 6 Oo goortuu guriga
yimaado, aan isugu yeedhin saaxiibbadiisa iyo derisyadiisa,
isagoo ku leh, Ila farxa, waayo, waxaan helay laxdaydii
iga hallowday? 7 Waxaan idinku leeyahay, Sidaas oo kale,
farxad ayaa jannada kaga jiri doonta dembile toobadkeena in
ka badan sagaal iyo sagaashan xaq ah oo aan toobadkeen
u baahnayn. 8 Ama naagtee baa toban daraakmo oo lacag
ah leh, oo hadday daraakmo lumiso, aan laambad shidin, oo
aan guriga xaaqin, oo aan dadaal ku doonin ilaa ay hesho?
9 Oo markay hesho, aan saaxiibbadeeda iyo derisyadeeda
isugu yeedhin iyadoo ku leh, Ila farxa, waayo, waxaan
helay daraakmadii iga luntay. 10 Waxaan idinku leeyahay,
Sidaas oo kale markii mid dembi leh toobadkeenoba, farxad
ayaa kaga jirta malaa'igaha Ilaah hortooda. 11 Wuxuuna
yidhi, Nin baa laba wiil lahaa. 12 Kii yaraa ayaa aabbihii
ku yidhi, Aabbow, waxaaga qaybtii aan heli lahaa i sii.
Markaasuu iyaga u qaybiyey wuxuu ku noolaa. 13 Maalmo
aan badnayn dabadeed wiilkii yaraa waa wada urursaday
wax walbaba, oo dhul fog ayuu u safray, halkaas ayuuna
wixiisii ku khasaariyey, isagoo iska tumaya. 14 Goortuu
wada bixiyey dabadeed ayaa abaar daran dhulkaas ka
dhacday, wuuna bilaabay inuu baahdo. 15 Goortaasuu tegey
oo isku daray nin dadka dhulkaas ah, kan u diray beerihiisa
inuu doofaarro daajiyo. 16 Wuxuu damcay inuu calooshiisa
ka buuxiyo buunshihii doofaarradu ay cunayeen, ninnana
waxba ma uu siin. 17 Goortuu isgartay ayuu yidhi, Intee baa
kuwa aabbahay kiraystay haysata kibis ka badan in ku filan,
aniguna macaluul baan halkan ugu bakhtiyayaa. 18 Waan
kici oo aan aabbahay u tegi, oo waxaan ku odhan, Aabbow,
waxaan ku dembaabay jannada iyo hortaadaba. 19 Kol
dambe ma istaahilo in laygu yeedho wiilkaaga, ee iga dhig
sida kuwa aad kiraysatay midkood oo kale. 20 Markaasuu
kacay, oo wuxuu u yimid aabbihii, laakiin intuu weli ka fogaa
ayaa aabbihiis arkay, waana u naxariistay, oo ku soo orday
oo qoortuu iskaga duubay, oo dhunkaday. 21 Markaasaa
wiilkii ku yidhi, Aabbow, waxaan ku dembaabay jannada
iyo hortaadaba; kol dambe ma istaahilo in laygu yeedho
wiilkaaga. 22 Laakiin aabbihii ayaa addoommadiisii ku yidhi,
Dhaqso u soo bixiya khamiiska ugu wanaagsan oo u geliya,
kaatunna gacanta u geliya, kabona cagaha u geliya. 23 Dibigii
yaraa ee la shishleeyey keena oo gowraca, aynu cunno
oo faraxno, 24 waayo, wiilkaygan wuu dhintay, wuuna soo
noolaaday; wuu lumay, waana la helay. Markaasay bilaabeen
inay farxaan. 25 Laakiin wiilkiisii weynaa beerta buu ku jiray,
oo intuu soo socday oo guriga u soo dhowaanayay, wuxuu
maqlay muusika iyo cayaar. 26 Markaasuu midiidinyada
midkood u yeedhay oo weyddiiyey, Waa maxay waxaas? 27
Markaasuu ku yidhi, Walaalkaa ayaa yimid, aabbahaana
dibigii yaraa ee la shishleeyey ayuu u gowracay, waayo,
ladnaan buu ku helay. 28 Laakiin wuu cadhooday, oo inuu
galo ma doonayn, markaasaa aabbihiis soo baxay oo baryay.
29 Laakiin wuu u jawaabay, oo wuxuu aabbihiis ku yidhi,
Bal eeg, intaas oo sannadood ayaan kuu shaqaynayay,
oo weligay amarkaaga kama aan xadgudbin, oo weligaa
waxar iima aad siin inaan saaxiibbadayda la farxo, 30
Laakiin goortii uu yimid wiilkaagani waxaagii aad ku noolayd
dhillooyin la cunay, waxaad u gowracday dibigii yaraa ee la
shishleeyey. 31 Markaasuu ku yidhi, Wiilkaygiiyow, weligaa
waad ila joogtaa, oo waxayga oo dhan adigaa leh, 32 laakiin
waxaa inoo wanaagsanayd inaynu rayrayno oo faraxno,
waayo, waalaalkaagani waa dhintay, wuuna soo noolaaday;
wuu lumay, waana la helay.

16 Haddana wuxuu xertii ku yidhi, Waxaa jiri jiray nin
hodan ah oo wakiil lahaa, kan loogu ashtakeeyey
inuu alaabtiisa khasaarinayay. 2 Markaasuu u yeedhay
oo ku yidhi, Waa maxay waxan kugu saabsan ee aan
maqlayo? I sii xisaabtii wakiilnimadaada, waayo, hadda
ka dib wakiil sii ahaan kari maysid. 3 Markaasaa wakiilkii
isku yidhi, Maxaan sameeyaa, waayo, sayidkayga ayaa
wakiilnimadii iga qaadaya? Itaal aan wax ku qodo ma
lihi, inaan dawarsadona waan ka xishoonayaa. 4 Waan
garanayaa waxaan samaynayo, in goortii wakiilnimada layga
saaro ay dadku guryahooda iigu dhowayn doonaan. 5
Markaasuu u yeedhay mid walba oo sayidkiisu dayn ku
lahaa. Kii hore ayuu ku yidhi, Sayidkaygu immisuu kugu
leeyahay? 6 Wuxuu yidhi, Boqol qiyaasood oo saliid ah.
Markaasuu ku yidhi, Wixii laguu qoray soo qaad, oo dhaqso
u fadhiiso oo qor, Konton. 7 Markaasuu wuxuu mid kale
ku yidhi, Immisuu kugu leeyahay? Isaguna wuxuu yidhi,
Boqol qiyaasood oo sarreen ah. Markaasuu ku yidhi. Wixii
laguu qoray soo qaad, oo qor, Siddeetan. 8 Sayidkiisii ayaa

wakiilkii xaqa darnaa faaniyey, waayo, si caqli leh ayuu
u sameeyey, waayo, wiilashii wakhtigan waxay wiilasha
iftiinka kaga caqli badan yihiin waxa qarnigooda ku saabsan.
**(aiōn g165)** **9** Oo waxaan idinku leeyahay, Saaxiibbo ku
samaysta maalka xaqdarrada in goortuu dhammaado ay
idiinku dhoweeyaan degmooyinka weligood ah. **(aiōnios g166)**
**10** Kan waxa u yar aamin ku ah, ayaa weliba wax badan
aamin ku ah. Kan waxa u yar ku xaqdaran, ayaa waxa
badanna ku xaqdaran. **11** Haddii aydnaan maalka xaqdaran
aamin ku ahayn, waxa run ah yaa idinku aaminaya? **12**
Haddii aydnaan wixii qof kale leeyahay aamin ku ahayn, yaa
idin siinaya wixiinna? **13** Midiidinna laba sayid uma shaqayn
karo, waayo, mid buu nacayaa, kan kalena wuu jeclaanayaa,
ama mid buu la jirayaa, kan kalena wuu quudhsanayaa.
Uma wada shaqayn kartaan Ilaah iyo maal. **14** Farrisiintii
lacagta jeclayd ayaa waxaas oo dhan maqashay, wayna
ku qosleen. **15** Markaasuu wuxuu ku yidhi, Idinku waxaad
tihiin kuwa dadka hortooda isku soo caddeeya inaad xaq
tihiin, laakiin Ilaah waa garanayaa qalbiyadiinna, waayo,
wixii dadka dhexdooda lagu sarraysiiyaa, Ilaah hortiisa waa
ka karaahiyo. **16** Sharciga iyo nebiyadu waxay jireen ilaa
Yooxanaa; tan iyo wakhtigaas injiilka boqortooyada Ilaah
waa lagu wacdiyey, oo mid walbaba xoog buu ku galaa.
**17** Laakiin in sharciga dhibic keliya ka dhacdo waxaa ka
hawl yar in cirka iyo dhulku ay idlaadaan. **18** Mid walba oo
naagtiisa fura oo mid kale guursadaa wuu sinaystaa, oo kii
guursadaa mid nin laga furay wuu sinaystaa. **19** Waxaa jiri
jiray nin hodan ah oo dhar gududan oo jilicsan sidan jiray,
maalin walbana barwaaqo aad buu ugu farxi jiray. **20** Oo
waxaa albaabkiisa la dhigi jiray miskiin Laasaros la odhan
jiray, isagoo boogo miidhan leh, **21** oo doonaya in la siiyo
jajabkii miiska ninkii hodanka ahaa ka dhacay. Eeyduna way
iman jireen oo boogihiisa leefleefi jireen. **22** Waxaa dhacay
inuu miskiinkii dhintay, oo malaa'igahu waxay u qaadeen
laabtii Ibraahim. Ninkii hodanka ahaana waa dhintay, waana
la aasay. **23** Intuu Haadees ku jiray ayuu indhihiisa kor u
qaaday isagoo aad u silcaya; wuxuuna meel fog ka arkay
Ibraahim, iyo Laasaros oo laabtiisa ku tiirsan. **(Hadēs g86)** **24**
Markaasuu qayliyey oo yidhi, Aabbe Ibraahimow, ii naxariiso,
oo Laasaros ii soo dir inuu fartiisa caaraddeeda biyo ku
tiinbiyo oo carrabkayga ku qabowjiyo, waayo, anigu ololkan
ayaan ku silcayaa. **25** Laakiin Ibraahim wuxuu ku yidhi, Wiil
yahow, xusuuso inaad waxaagii wanaagsanaa heshay intii
aad noolayd, si la mid ah ayuu Laasaros waxa xun helay,
laakiin haddeer isaga halkan ayaa lagu raaxaysiiyey, adiguse
waad silcaysaa. **26** Weliba annaga iyo idinka waxaa layna
dhex dhigay bohol aad u weyn, si kuwa doonaya inay halkan
ka sii tallaabaan inay idiin yimaadaan aanay u karin, oo kuwa
xaggaasna ayna noogu soo tallaabin. **27** Markaasuu wuxuu
ku yidhi, Aabbow, waxaan kaa baryayaa haddaba inaad
guriga aabbahay isaga u dirtid, **28** waayo, shan walaalo
ah baan leeyahay, si uu ugu warramo inaanay iyaguna
meeshan silaca leh iman. **29** Laakiin Ibraahim wuxuu ku
yidhi, Waxay leeyihiin Muuse iyo nebiyada ee ha maqleen.
**30** Markaasuu wuxuu ku yidhi, Maya, Aabbe Ibraahimow,
laakiin haddii qof kuwii dhintay uga tago, way toobadkeeni
doonaan. **31** Wuxuuse ku yidhi, Haddii ay maqli waayaan
Muuse iyo nebiyada, in kastoo qof kuwii dhintay ka soo sara
kaco, la oggolaysiin kari maayo inay rumaystaan.

**17** Wuxuu xertiisii ku yidhi, Ma suurtowdo inaan xumaantu
iman, laakiin waa u hoog kan ay xumaantu ka timaado.
**2** In qof yaryarkan midkood xumeeyo, waxaa uga roon in
dhagaxshiid luqunta looga lalmiyo oo badda lagu tuuro. **3** Iska
dhawra. Walaalkaa hadduu dembaabo, canaano; hadduuna
toobadkeeno, cafi. **4** Hadduu toddoba goor maalintii kugu
dembaabo, oo toddoba goor kuu soo jeesto, isagoo leh, Waa
toobadkeenay, waa inaad cafido. **5** Markaasay rasuulladii
waxay Rabbiga ku yidhaahdeen, Rumaysad noo kordhi. **6**
Rabbiguna wuxuu ku yidhi, Haddaad leedihiin rumaysad
iniin khardal le'eg, waxaad ku odhan lahaydeen geedkan
sukamin, Ruq, oo badda ku beeran, wuuna idin addeeci
lahaa. **7** Laakiin kiinnee baa leh addoon dhulka jaraya
ama adhi jiraya, oo ku odhan doona goortuu beerta ka
yimaado, Dhaqso u kaalay oo cunto u fadhiiso? **8** Laakiin
miyaanu ku odhan doonin, Diyaari waxaan ku casheeyo, oo
gunto, oo ii adeeg intaan wax cunayo oo cabbayo, kolkaa
dabadeed ayaad wax cuni oo cabbi? **9** Miyuu addoonkii u
mahadnaqayaa, waayo, wuxuu sameeyey wixii la amray? **10**
Sidaas oo kale idinkuna goortaad samaysaan wixii laydinku
amray oo dhan, waxaad tidhaahdaan, Addoommo aan waxtar
lahayn baannu nahay; wixii aannu lahayn inaannu samayno
ayaannu samaynay. **11** Waxaa dhacay intay Yeruusaalem ku
sii socdeen inuu Samaariya iyo Galili dhex marayay. **12** Oo
goortuu tuulo galay, waxaa la kulmay toban nin oo baras leh
oo meel fog ka istaagay. **13** Markaasay codka kor u qaadeen
iyagoo leh, Ciisow, Macallimow, noo naxariiso. **14** Goortuu
arkay, wuxuu ku yidhi, Taga oo istusa wadaaddada. Oo
waxaa dhacay, intay sii socdeen, inay daahirsameen. **15**
Midkood goortuu arkay inuu bogsaday, ayuu soo jeestay
oo cod weyn Ilaah ku ammaanay. **16** Oo wejigiisa ayuu
cagihiisa ag dhigay oo u mahadnaqay. Wuxuuna ahaa
reer Samaariya. **17** Ciisena waa u jawaabay oo ku yidhi,
Tobankii miyaanay daahirsamin? Laakiin meeye sagaalkii?

18 Miyaan la arag kuwa u soo noqday inay Ilaah ammaanaan,
shisheeyahan maahee? 19 Markaasuu ku yidhi, Kac oo soco.
Rumaysadkaaga ayaa ku bogsiiyey. 20 Farrisiintii goortay
weyddiiyeen oo ku yidhaahdeen, Goormay boqortooyada
Ilaah imanaysaa? wuxuu ugu jawaabay, Boqortooyada Ilaah
dhawrid ku iman mayso. 21 Lamana odhan doono, Waa tan!
ama, Waa taas! waayo, bal eega, boqortooyada Ilaah waa
idinku dhex jirtaa. 22 Markaasuu xertii ku yidhi, Maalmuhu
waa iman doonaan goortaad dooni doontaan inaad aragtaan
maalmaha Wiilka Aadanaha middood, mana arki doontaan.
23 Waxaana laydinku odhan doonaa, Waa taas! Waa tan! Ha
bixina, hana raacina. 24 Waayo, sida hillaacu markuu dhinaca
hoose oo cirka ka hillaaco oo ilaa dhinaca kale oo hoose oo
cirka u ifiyo, sidaas oo kale ayuu Wiilka Aadanahuna ahaan
doonaa maalintiisa. 25 Laakiin kolka hore waxay waajib ugu
tahay inuu wax badan ku xanuunsado oo uu qarniganu diido
isaga. 26 Oo sidii wakhtigii Nuux ahaa, sidaas oo kale ayay
noqon doontaa maalmaha Wiilka Aadanaha. 27 Wax bay
cuni jireen oo cabbi jireen, wayna guursan jireen oo guur
baa la siin jiray, ilaa maalintii Nuux uu doonnida galay, oo
daadkii yimid oo wada baabbi'iyey. 28 Sidaas oo kale ayay
weliba ahayd maalmihii Luud. Wax bay cuni jireen oo cabbi
jireen, wax bayna iibsan jireen oo iibin jireen, oo beeran
jireen, oo dhisan jireen. 29 Laakiin maalintii Luud ka baxay
Sodom ayay dab iyo baaruud cirka kaga soo daateen oo
wada baabbi'iyeen. 30 Si la mid ah ayay noqon doontaa
maalinta Wiilka Aadanahu soo muuqdo. 31 Maalintaas kii
guriga fuushanu, oo alaabtiisu guriga ku jirto, yaanu u soo
degin inuu soo qaato; kii beerta joogaana sidaas oo kale
yaanu dib u noqon. 32 Naagtii Luud xusuusta. 33 Kan doona
inuu naftiisa badbaadiyo waa lumin doonaa, laakiin kan
lumiya ayaa badbaadin doona. 34 Waxaan idinku leeyahay,
Habeenkaas laba nin ayaa sariir wada joogi doona; mid
waa la qaadi doonaa, kan kalena waa laga tegi doonaa. 35
Waxaana jiri doona laba naagood oo wax isla shiidi doona,
mid waa la qaadi doonaa, tan kalena waa laga tegi doonaa.
36 Waxaana beerta ku jiri doona laba nin, mid waa la qaadi
doonaa, kan kalena waa laga tegi doonaa. 37 Markaasay u
jawaabeen oo ku yidhaahdeen, Xaggee, Sayidow? Wuxuuna
ku yidhi, Meeshii bakhtigu yaal, halkaas ayaa gorgorraduna
isugu ururi doonaan.

**18** Si Ciise u tuso inay waajib ku tahay iyaga inay mar
walba tukadaan oo aanay ka qalbi jabin, wuxuu iyaga
kula hadlay masaal isagoo leh, 2 Waxaa magaalo joogay
xaakin aan Ilaah ka baqi jirin, ninnana aan danayn jirin. 3
Waxaana magaaladaas joogtay carmal ninkeedii ka dhintay,
marar badanna way u timid, iyadoo ku leh, Cadowgayga iga
xaq sii. 4 Intii wakhti ah ayuu yeeli waayay, laakiin dabadeed
wuxuu isku yidhi, In kastoo aanan Ilaah ka baqin, oo aanan
ninna danayn, 5 weliba dhibta ay carmalkan i dhibayso
aawadeed, waan xaq siin doonaa, si aanay marar badan
iigu soo noqnoqon oo ii daalin. 6 Markaasaa Rabbigu yidhi,
Maqla wixii xaakinkii xaqa darnaa yidhi. 7 Ilaahna miyaanu
xaq siin doonin kuwuu doortay oo habeen iyo maalinba u
qayliya; oo miyaanu u dulqaadan doonin? 8 Waxaan idinku
leeyahay, Dhaqsoba wuu u xaq siin doonaa; hase ahaatee
goortuu Wiilka Aadanahu yimaado, markaas rumaysad ma
ka heli doonaa dhulka? 9 Masaalkan ayuu kula hadlay qaar
ismoodayay inay xaq yihiin oo kuwa kale quudhsaday. 10
Laba nin ayaa tegey inay macbudka ku tukadaan; mid Farrisi
buu ahaa, kan kalena cashuurqaade. 11 Farrisigii intuu
istaagay ayuu waxyaalahan isugu tukaday, Ilaahow, waxaan
kuugu mahadnaqayaa inaanan ahayn sida nimanka kale oo
wax dulma, iyo kuwa xaqa daran, iyo dhillayaasha, ama
xataa sida cashuurqaadahan. 12 Toddobaadkiiba laba kol
ayaan soomaa, waxaan haysta oo dhanna toban meelood
ayaan meel ka bixiyaa. 13 Laakiin cashuurqaadihii meel
fog ayuu ka istaagay, ma uuna doonaynin inuu indhihiisa
cirka u qaado, laakiin laabtiisa ayuu garaacay isagoo leh,
Ilaahow, ii naxariiso anigoo dembi leh. 14 Waxaan idinku
leeyahay, Kan iyo kii kale, kan baa gurigiisa tegey isagoo
la caddeeyey inuu xaq yahay; waayo, mid kasta oo isa
sarraysiiya waa la hoosaysiin doonaa, oo kii is-hoosaysiiyana
waa la sarraysiin doonaa. 15 Ilmo yaryar ayay u keeneen
inuu taabto, laakiin goortii xertii aragtay, ayay canaanteen.
16 Laakiin Ciise ayaa u yeedhay oo ku yidhi, Ilmaha yaryar
daaya, ha ii yimaadeene, hana diidina, waayo, kuwan oo
kale ayaa ka mid ah boqortooyada Ilaah. 17 Runtii waxaan
idinku leeyahay, Ku alla kii aan boqortooyada Ilaah u aqbalin
sida ilmo yar oo kale, meeshaas ma uu geli doono. 18
Taliye ayaa weyddiiyey isagoo leh, Macallin wanaagsanow,
maxaan sameeyaa inaan nolosha weligeed ah dhaxlo?
**(aiōnios g166)** 19 Markaasaa Ciise ku yidhi, Maxaad iigu
yeedhaysaa wanaagsanow? Mid wanaagsan ma jiro mid
maahee, kaasuna waa Ilaah. 20 Qaynuunnada waad taqaan,
Waa inaanad sinaysan, Waa inaanad qudh gooyn, Waa
inaanad wax xadin, Waa inaanad marag been ah furin,
Aabbahaa iyo hooyadaana maamuus. 21 Markaasuu yidhi,
Kuwaas oo dhan tan iyo yaraantaydii waan dhawray. 22 Ciise
goortuu waxaas maqlay ayuu ku yidhi, Weli wax keliya ayaa
kuu dhiman. Waxaad haysatid oo dhan iibi, oo masaakiinta
u qaybi, oo waxaad jannada ku lahaan doontaa maal, ee
kaalay oo i soo raac. 23 Laakiin goortuu waxaas maqlay ayuu

aad uga caloolxumaaday, waayo, aad buu hodan u ahaa. 24
Ciise goortuu arkay, wuxuu yidhi, Kuwa hodanka ah waa
ku adag tahay inay boqortooyada Ilaah galaan, 25 waayo,
nin hodan ah inuu boqortooyada Ilaah galo waxaa ka hawl
yar in awr irbad daloolkeeda ka duso. 26 Markaasaa kuwa
maqlay waxay ku yidhaahdeen, Haddaba yaa badbaadi
kara? 27 Wuxuuse ku yidhi, Waxa aan dadka u suurtoobin,
Ilaah waa u suurtoobaan. 28 Butros ayaa ku yidhi, Bal
eeg, waxayagii ayaannu ka tagnay, waana ku raacnay. 29
Wuxuuna ku yidhi, Runtii waxaan idinku leeyahay. Ma jiro nin
boqortooyada Ilaah aawadeed uga tegey guri, ama afo, ama
walaalo, ama waalid, ama carruur, 30 oo aan haatan helayn
labanlaab badan, wakhtiga imanayana nolosha weligeed
ah. **(aiōn g165, aiōnios g166)** 31 Laba-iyo-tobankii ayuu watay
oo ku yidhi, Waxaynu ku soconnaa Yeruusaalem, oo wax
walba oo nebiyadu qoreen ayaa Wiilka Aadanaha u noqon
doona. 32 Waayo, isaga waxaa loo dhiibi doonaa dadka aan
Yuhuudda ahayn, waana lagu kajami doonaa, oo la caayi
doonaa, oo lagu tufi doonaa, 33 wayna karbaashi doonaan
oo dili doonaan, maalinta saddexaadna wuu soo sara kici
doonaa. 34 Laakiin waxyaalahaas waxba kama ay garan,
hadalkaasna waa ka qarsoonaa, mana ay garan wixii la
yidhi. 35 Waxaa noqotay markuu Yerixoo ku soo dhowaaday,
in nin indha la' jidka ag fadhiyey oo dawarsanayay, 36 oo
goortuu maqlay dadka badan oo ag maraya ayuu weyddiiyey
waxaas waxay ahaayeen. 37 Waxay u sheegeen in Ciisihii
Reer Naasared ag marayo. 38 Markaasuu qayliyey isagoo
leh, Ciise, ina Daa'uudow, ii naxariiso. 39 Kuwa hor marayay
ayaa canaantay si uu u aamuso, laakiin si ka badan ayuu
ugu qayliyey, Ina Daa'uudow, ii naxariiso. 40 Markaasaa
Ciise joogsaday oo wuxuu ku amray in loo keeno, oo goortuu
u soo dhowaaday ayuu weyddiiyey, oo ku yidhi, 41 Maxaad
doonaysaa inaan kuu sameeyo? Wuxuu ku yidhi, Sayidow,
inaan wax arko. 42 Markaasaa Ciise ku yidhi, Wax arag;
rumaysadkaaga ayaa ku bogsiiyey. 43 Kolkiiba ayuu wax
arkay, wuuna raacay oo Ilaah ammaanay. Dadkii oo dhanna
goortay arkeen, ayay Ilaah ammaaneen.

**19** Ciise wuxuu galay oo dhex marayay Yerixoo. 2 Oo bal
eeg, waxaa jiray nin Sakhayos la odhan jiray; kan ahaa
madaxda cashuurqaadayaasha, oo hodan buuna ahaa. 3
Wuxuuna doonayay inuu Ciise arko cid uu yahay, wuuna kari
waayay dadkii badnaa aawadood, waayo, wuu gaabnaa. 4
Hore buu u orday, oo wuxuu fuulay geed sukomoor inuu
isaga arko, waayo, goor dhow jidkaas ayuu soo mari lahaa.
5 Ciise goortuu meeshii yimid, ayuu kor u eegay, oo wuxuu
ku yidhi, Sakhayosow, dhaqso u soo deg, waayo, maanta
waa inaan gurigaaga joogo. 6 Dhaqso ayuu u soo degay, oo
farxad ayuu ku soo dhoweeyey. 7 Dadkii goortay arkeen,
kulligood way wada gunuunaceen, iyagoo leh, Nin dembi leh
ayuu u marti galay. 8 Sakhayos waa istaagay oo Rabbiga
ku yidhi, Bal eeg, Sayidow, maalkayga badhkiisa ayaan
masaakiinta siinayaa, oo haddii aan nin wax ka dulmay,
waxaan u celinayaa afar laab. 9 Ciise wuxuu ku yidhi,
Maanta badbaadinta ayaa gurigan timid, waayo, isaguna
waa ina Ibraahim. 10 Waayo, Wiilka Aadanahu wuxuu u yimid
inuu kii hallaabay doondoono oo badbaadiyo. 11 Goortay
waxaas maqleen, masaal buu ku daray oo ku hadlay, waayo,
wuxuu ku dhowaa Yeruusaalem, waxayna u maleeyeen
boqortooyada Ilaah inay markiiba soo muuqan doonto. 12
Sidaa darteed wuxuu yidhi, Nin sharaf leh ayaa dal fog
tegey inuu boqortooyo soo helo oo soo noqdo. 13 Wuxuu u
yeedhay tobankiisa addoon, oo wuxuu u dhiibay toban mina,
oo ku yidhi, Ku baayacmushtara ilaa aan soo noqdo. 14
Laakiin dadkii magaaladiisa ayaa nacay, oo waxay ka daba
direen ergo iyagoo leh, Dooni mayno ninkaas inuu boqor
noo ahaado. 15 Goortuu soo noqday isagoo boqortooyadii
qaatay, wuxuu ku amray in loo yeedho addoommadii uu
lacagtii u dhiibay inuu ogaado mid kasta intuu ka faa'iiday
baayacmushtarigii. 16 Kii hore ayaa u yimid oo ku yidhi,
Sayidow, minahaagii ayaa toban kale laga faa'iiday. 17
Markaasuu ku yidhi, Si wanaagsan baad yeeshay, addoon
yahow wanaagsan. Wax yar ayaad aamin ku ahayd, ee toban
magaalo u sarree. 18 Markaasaa kii labaad yimid isagoo leh,
Sayidow, minahaagii waxaa laga faa'iiday shan mina. 19
Kaasna wuxuu ku yidhi, Adna shan magaalo u sarree. 20 Kii
kalena waa yimid isagoo leh, Sayidow, waa kaa minahaagii
aan maro yar ku guntay oo meel dhigay. 21 Waayo, waan
kaa baqay, maxaa yeelay, nin ba'an baad tahay; waxaad
qaadataa waxaanad dhigan, oo waxaad gurataa waxaanad
beeran. 22 Wuxuu ku yidhi, Waxaa afkaaga ka soo baxay
ayaan kugu xukumayaa, addoon yahow sharka leh. Waad
ogayd inaan ahay nin ba'an oo qaato wixii aanan dhigan oo
gurto wixii aanan beeran. 23 Maxaad haddaba lacagtaydii
baangiga u dhigi weyday, si, markaan imaado, aan u soo
qaato lacagtaydii iyo faa'iidadeediiba? 24 Markaasuu ku
yidhi kuwii ag taagnaa, Minaha ka qaada oo u dhiiba kan
tobanka mina haya. 25 Waxay ku yidhaahdeen, Sayidow,
toban mina ayuu hayaa. 26 Waxaan idinku leeyahay, Mid
walba oo wax haysta waa la siin doonaa, kii aan waxba
haysanse waa laga qaadi doonaa xataa wuxuu haysto.
27 Laakiin cadowyadaydan oo aan doonin inaan boqor u
ahaado halkan keena oo hortayda ku laaya. 28 Goortuu
waxaas ku hadlay ayuu hore u socday oo Yeruusaalem
tegey. 29 Goortuu Beytfaage iyo Beytaniya ku dhowaaday

ilaa buurta Buur Saytuun la yidhaahdo ayuu laba xer ah
diray, **30** isagoo leh, Tuulada idinka soo hor jeedda taga, tan
goortaad gashaan aad ka helaysaan qayl xidhan oo aan
ninna weligii fuulin; soo fura oo keena. **31** Haddii laydin
weyddiiyo oo laydinku yidhaahdo, Maxaad u furaysaan?
waxaad ku tidhaahdaan, Sayidkaa u baahan. **32** Markaasay
kuwii la diray tageen oo heleen sidii lagu yidhi. **33** Kolkay
qaylka furayeen ayaa kuwii lahaa ku yidhaahdeen, Maxaad
qaylka u furaysaan? **34** Waxay ku yidhaahdeen, Sayidkaa
u baahan. **35** Markaasay Ciise u keeneen, oo dharkoodii
bay qaylkii dusha ka saareen, oo Ciise ayay fuusheen.
**36** Oo intuu socday, dharkoodii ayay jidka ku gogleen. **37**
Goortuu ku soo dhowaanayay xataa meeshii Buur Saytuun
laga dego, dadkii oo dhan oo xertii ahaa ayaa bilaabay inay
farxaan, oo cod weyn Ilaah ku ammaanaan waxa xoogga
leh oo dhan oo ay arkeen aawadood, **38** iyagoo leh, Waxaa
barakaysan Boqorka Rabbiga magiciisa ku imanaya. Nabadi
jannada ha ku jirto, ammaantuna meelaha ugu sarreeya. **39**
Farrisiintii qaarkood oo dadkii badnaa ku dhex jiray ayaa
ku yidhi, Macallimow, xertaada canaano. **40** Markaasuu u
jawaabay oo ku yidhi, Waxaan idinku leeyahay, Kuwani
hadday aamusaan, dhagaxyada ayaa qaylin doona. **41**
Oo markuu ku soo dhowaaday, ayuu magaalada arkay
oo u ooyay, **42** isagoo leh, Adigu haddii aad maalintan
garan lahayd waxa nabad ah! Laakiin hadda waa laga
qariyey indhahaaga. **43** Waayo, maalmuhu way kuu iman
doonaan markii cadowyadaadu ay xaggaaga dhufays u
soo qodan doonaan, oo ay kugu wareegi doonaan oo ay
dhinac walba kaa celin doonaan. **44** Way ku dumin doonaan,
adiga iyo carruurtaada kugu jirta, oo kuguma dayn doonaan
dhagax dhagax dul saaran, waayo, waad garan weyday
wakhtigii booqashadaada. **45** Wuxuu galay macbudka oo
bilaabay inuu ka eryo kuwii wax ku iibinayay, **46** isagoo
ku leh, Waa qoran tahay, Gurigaygu wuxuu ahaan doonaa
guriga tukashada, laakiin idinku waxaad ka dhigteen god
tuugo. **47** Maalin walba ayuu macbudka ku jiri jiray isagoo
wax baraya; laakiin wadaaddada sare iyo culimmada iyo
madaxda dadku waxay dooneen inay dilaan, **48** oo ay
waayeen waxay ku sameeyaan, waayo, dadka oo dhan ayaa
aad u dhegaysanayay.

**20** Maalmahaa middood intuu Ciise dadka macbudkii
wax ku barayay oo injiilka kaga dhex wacdiyeyey,
waxaa dhacay in wadaaddada sare iyo culimmada ula
yimaadeen waayeellada **2** oo la hadleen oo ku yidhaahdeen,
Noo sheeg, Amarkee baad waxan ku samaysaa? Oo yuu
yahay kan amarkan ku siiyey? **3** Markaasuu u jawaabay
oo ku yidhi, Aniguna hal baan idin weyddiinayaa, iina
sheega. **4** Baabtiiskii Yooxanaa ma wuxuu ka yimid xagga
jannada mase dadka? **5** Dhexdooda ayay iskala hadleen
iyagoo leh, Haddaynu nidhaahno, Xagga jannada, wuxuu
odhanayaa, Maxaad u rumaysan weydeen? **6** Laakiin haddii
aynu nidhaahno, Xagga dadka, dadka oo dhan ayaa ina
dhagxinaya, waayo, waa la aaminsiiyey inuu Yooxanaa nebi
ahaa. **7** Markaasay waxay ugu jawaabeen inaanay garan
meeshuu ka yimid. **8** Ciisena wuxuu ku yidhi, Aniguna idiin
sheegi maayo amarka aan waxan ku sameeyo. **9** Wuxuu
bilaabay inuu masaalkan dadka kula hadlo. Nin baa wuxuu
beertay beer canab ah, oo niman beerrey ah u kiraystay,
markaasuu dal kale tegey, oo wax badan ku maqnaa. **10**
Goortii xilligii yimid, ayuu addoon u soo diray beerreydii
inay isaga siiyaan midhaha beerta, laakiin beerreydii ayaa
garaacday oo waxla'aan ku dirtay. **11** Haddana wuxuu
diray addoon kale, kaasna way garaaceen, oo ceebeeyeen,
oo waxla'aan ku direen. **12** Haddana mid saddexaad
ayuu diray, kaasna way dhaawaceen oo iska tuureen. **13**
Markaasaa sayidka beerta wuxuu yidhi, Maxaan sameeyaa?
Waxaan dirayaa wiilkaygaan jeclahay, malaha way maamuusi
doonaan. **14** Laakiin beerreydii goortay arkeen, waxay isku
yidhaahdeen, Kanu waa kii dhaxalka lahaa; aan dilnee, si
aynu dhaxalka u lahaanno. **15** Markaasay beertii canabka
ahayd dibaddeeda ku tuureen, wayna dileen. Haddaba
sayidkii beerta canabka ah muxuu iyaga ku samayn doonaa?
**16** Wuu iman doonaa oo beerreydaas dili doonaa, oo dad
kale ayuu beerta canabka ah u dhiibi doonaa. Goortay taas
maqleen waxay yidhaahdeen, Yaanay noqon. **17** Laakiin
wuu eegay oo ku yidhi, Haddaba muxuu yahay waxan la
qoray, Dhagaxii kuwa wax dhisaa ay diideen, Kaasu wuxuu
noqday madaxa rukunka? **18** Mid kasta oo dhagaxaas ku
dhacaa, wuu jejebi doonaa, laakiin kan uu ku dhoco, wuu
burburin doonaa. **19** Saacaddaas qudheeda ayaa culimmadii
iyo wadaaddadii sare dooneen inay isagii qabtaan; laakiin
dadkay ka baqeen; waayo, waxay garteen inuu masaalkan
iyaga kaga hadlay. **20** Wayna dayayeen, oo ay u soo
direen jaajuusiin iska dhigaya dad xaq ah, si ay hadalkiisa
ugu qabtaan, oo ay ugu gacangeliyaan talada iyo amarka
taliyaha. **21** Markaasay weyddiiyeen oo ku yidhaahdeen,
Macallimow, waxaannu og nahay inaad si hagaagsan wax
u tidhaahdo oo wax u bartid, oo aanad ninna u eexan,
laakiin aad jidka Ilaah run ku bartid. **22** Ma xalaal baa
inaannu cashuur Kaysar siinno ama inaannan siin? **23**
Laakiin khiyaanadooda wuu gartay, oo wuxuu ku yidhi, **24**
Dinaar i tusa. Yaa leh masawirkan iyo qorniinkan ku yaal?
Waxay yidhaahdeen, Kaysar baa leh. **25** Markaasuu ku

yidhi, Haddaba Kaysar siiya wixii Kaysar leeyahay, Ilaahna
siiya wixii Ilaah leeyahay. **26** Hadalkiisa way ku qaban kari
waayeen dadka hortiisa, wayna ka yaabeen jawaabtiisa,
oo way aamuseen. **27** Waxaa u yimid qaar Sadukiin ah,
kuwii odhan jiray, Sarakicidda kuwii dhintay ma jirto. **28** Oo
waxay weyddiiyeen oo ku yidhaahdeen, Macallimow, Muuse
wuxuu noo qoray, Nin walaalkiis hadduu dhinto isagoo naag
leh oo aan carruur lahayn, walaalkiis naagtiisa waa inuu
dumaalo oo uu carruur walaalkiis u dhalo. **29** Haddaba
waxaa jiray toddoba walaalo ah. Kii ugu horreeyey naag
buu qabay, wuuna dhintay carruurla'aan. **30** Kii labaadna
wuu guursaday, **31** oo kii saddexaadna waa dumaalay.
Sidaasay toddobadii u wada guursadeen, carruurna kama ay
tegin, wayna dhinteen. **32** Kulligood dabadeed naagtiina waa
dhimatay. **33** Haddaba wakhtiga sarakicidda kuwii dhintay,
iyaga kee bay naagtiisa ahaan doontaa? Waayo, toddobadu
way wada guursadeen. **34** Ciise wuxuu ku yidhi, Wiilashii
wakhtigan waa guursadaan, guurna waa la siiyaa, **(aiōn
g165)** **35** laakiin kuwa loo xisaabay inay istaahilaan inay
gaadhaan wakhtigaas iyo ka soo sarakicidda kuwii dhintay
ma guursadaan, guurna lama siiyo, **(aiōn g165)** **36** waayo, kol
dambe ma dhiman karaan, maxaa yeelay, waxay yihiin sida
malaa'igaha, oo waxay yihiin wiilashii Ilaah iyagoo ah wiilashii
sarakicidda. **37** Laakiin in kuwii dhintay la sara kiciyo Muuse
ayaa tilmaamay xaggii geedka markuu Rabbiga ugu yeedhay
Ilaaha Ibraahim iyo Ilaaha Isxaaq iyo Ilaaha Yacquub. **38**
Laakiin isagu ma aha Ilaaha kuwa dhintay, laakiin waa
Ilaaha kuwa nool, waayo, dhammaan isagay u nool yihiin.
**39** Culimmada qaarkood ayaa u jawaabay oo ku yidhi,
Macallimow, si wanaagsan ayaad u hadashay. **40** Kol dambe
kuma ay dhicin inay wax weyddiiyaan. **41** Wuxuuna ku yidhi,
Sidee bay u yidhaahdaan, Masiixu waa ina Daa'uud? **42**
Daa'uud qudhiisa ayaa kitaabkii Sabuurrada ku leh, Rabbigu
wuxuu Sayidkayga ku yidhi, Midigtayda fadhiiso, **43** Ilaa
aan cadaawayaashaada cagahaaga hoostooda geliyo. **44**
Haddaba Daa'uud ayaa ugu yeedhay Sayid, ee sidee buu
wiilkiisa u yahay? **45** Dadkii oo dhan oo maqlaya, ayuu
xertiisii ku yidhi, **46** Iska jira culimmada oo doonaya inay
khamiisyo dhaadheer ku socdaan, oo jecel salaanta suuqa,
iyo kursiyada hore oo sunagogyada, iyo meelaha hore oo
diyaafadaha, **47** kuwa wada laasta guryaha carmallada, oo
tukashooyin dhaadheer istusid u tukada. Kuwaas waxay heli
doonaan xisaab aad u daran.

**21** Kor buu u eegay, oo wuxuu arkay kuwa hodanka ah
oo hadiyadahoodii khasnadda ku ridaya. **2** Wuxuuna
arkay carmal miskiin ah oo meeshaas laba lacag ah oo
yaryar ku ridaysa. **3** Markaasuu yidhi, Runtii waxaan idinku
leeyahay, Carmalkan miskiinta ah waxay ku ridday wax ka
badan wixii ay dhammaan ku rideen. **4** Waayo, kuwaas oo
dhan waxoodii badnaa ayay wax kaga rideen hadiyadaha,
iyaduse miskiinnimadeeda waxay kaga ridday wixii ay ku
noolaan lahayd oo dhan. **5** Oo qaar kolkay macbudka
ka hadlayeen in dhagaxyo wanaagsan iyo hadiyado lagu
qurxiyey, wuxuu yidhi, **6** Waxaa imanaya maalmo goortii
kuwaas aad arkaysaan aan dhagax dhagax kale dushiisa
lagu dul dayn doonin oo aan la dumin doonin. **7** Markaasay
weyddiiyeen oo ku yidhaahdeen, Macallimow, goormay
waxyaalahanu ahaan doonaan, oo calaamadu maxay ahaan
doontaa goortii waxyaalahanu ay dhowaan doonaan? **8**
Markaasuu yidhi, Iska eega yaan laydin khiyaanayn, waayo,
qaar badan ayaa magacayga ku iman doona, oo waxay
odhan doonaan, Anigu waxaan ahay isaga; iyo, Wakhtigu
waa soo dhowaaday. Ha raacina. **9** Oo markaad dagaallo
iyo rabshooyin maqashaan ha baqanina, waayo, kolka hore
waxyaalahanu waa inay dhacaan, laakiin dhammaadku
kolkiiba ma aha. **10** Markaasuu ku yidhi, Quruunba quruun
bay ku kici doontaa, boqortooyona boqortooyo. **11** Waxaa
meelo kala duwan ka dhici doona dhulgariir iyo abaaro
iyo cudurro, samadana waxaa laga arki doonaa waxyaalo
cabsi leh iyo calaamooyin waaweyn. **12** Waxyaalahan oo
dhan hortood gacmahooday idin saari doonaan oo idin
silcin doonaan oo idiin dhiibi doonaan sunagogyada iyo
xabsiyada, oo waxaa magacayga aawadiis laydiin hor geeyn
doonaa boqorro iyo taliyayaal. **13** Waxayna idinku noqon
doontaa marag. **14** Sidaa darteed qalbiyadiinna geliya
inaydnaan hore ugu fikirin waxaad ku jawaabi doontaan.
**15** Waayo, waxaan idin siin doonaa af iyo xigmad aanay
cadaawayaashiinna oo dhammu ka adkaan karin oo aanay
ka gees hadli karin. **16** Laakiin idinka waxaa idin gacangelin
doona waalidkiinna, iyo walaalahiinna, iyo xigaalkiinna,
iyo saaxiibbadiinna, qaarkiinnana waa la dili doonaa. **17**
Dadka oo dhan ayaa magacayga aawadiis idiin necbaan
doona. **18** Tinna madaxiinna kama lumi doono. **19** Waa
inaad naftiinna ku haysataan dulqaadashadiinna. **20** Laakiin
goortaad aragtaan Yeruusaalem oo colal ku wareegsan
yihiin, markaas ogaada in hallaynteedu dhow dahay. **21**
Markaas kuwa Yahuudiya joogaa buuraha ha u carareen,
kuwa gudaheeda ku jiraana ha ka baxeen, kuwa beeraha
joogaana yaanay gelin. **22** Waayo, kuwanu waa maalmo
aargudasho in wixii la qoray oo dhammu ay noqdaan. **23**
Laakiin waa u hoog kuwa uurka leh iyo kuwa wakhtigaas
ilmo nuujinaya, waayo, dhulka dhib weyn ayaa ka dhici
doonta, dadkanna cadho. **24** Waxayna ku dhici doonaan

seef afkeeda, oo waa la qabsan doonaa, oo quruumaha oo
dhan la geeyn doonaa; quruumuhuna Yeruusaalem ayay ku
tuman doonaan ilaa wakhtiga quruumuhu ka dhammaado.
25 Calaamooyin ayaa laga arki doonaa qorraxda, iyo dayaxa,
iyo xiddigaha; dhulkana waxaa ku jiri doona dhib quruumahu
ka welwelaan guuxa badda iyo hirarka aawadood. 26
Dadkuna waxay la suuxi doonaan baqdin iyo filasho waxa
dunida iman doona, waayo, xoogagga cirka ayaa la gariirin
doonaa. 27 Markaasay arki doonaan Wiilka Aadanaha oo
daruur ku imanaya, isagoo leh xoog iyo ammaan weyn. 28
Laakiin goortii ay waxaasu bilaabaan inay dhacaan, kor eega,
madaxyadiinnana kor u qaada, waayo, madaxfurashadiinnu
waa dhow dahay. 29 Markaasuu masaal kula hadlay, Bal
eega berdaha iyo dhirta oo dhan; 30 goortay caleemo
bixiyaan waad arkaysaan oo garanaysaan inuu roobku
haddaba dhow yahay. 31 Sidaas oo kale idinkuna goortaad
aragtaan waxaas oo dhacaya, garta in boqortooyadii Ilaah
dhow dahay. 32 Runtii waxaan idinku leeyahay, Qarniganu
ma idlaan doono intaanay wax walba dhicin. 33 Cirka iyo
dhulku waa idlaan doonaan, laakiinse ereyadaydu ma idlaan
doonaan. 34 Laakiin iska jira, yaan qalbiyadiinnu la cuslaan
dhereg badan iyo sakhraannimo iyo ka welwelidda ifkan,
oo yaan maalintaasu idiin soo kedin sida dabin oo kale. 35
Waayo, sidaas oo kale ayaa ku dhacaysa kulli kuwa dunida
oo dhan jooga. 36 Laakiin wakhti walbaba soo jeeda, idinkoo
Ilaah baryaya inaad xoog yeelataan si aad uga baxsataan
waxaas dhici doonaa oo dhan, oo aad Wiilka Aadanaha isu
hor taagtaan. 37 Maalin walba ayuu macbudka wax ku bari
jiray, habeen walbana dibadda ayuu u bixi jiray, oo wuxuu
baryi jiray buurta la odhan jiray Buur Saytuun. 38 Dadka oo
dhammuna aroortii ayay macbudka ugu iman jireen inay
dhegaystaan.

**22** Waxaa soo dhowaatay Iiddii Kibistii-aan-khamiirka-
lahayn oo la yidhaahdo Kormaridda. 2 Markaasaa
wadaaddadii sare iyo culimmadii waxay dooneen si ay u
dilaan isaga, waayo, dadka ayay ka baqeen. 3 Markaasaa
Shayddaanku wuxuu galay Yuudas, kan Iskariyod la odhan
jiray, isagoo ka mid ah tirada laba-iyo-tobanka. 4 Markaasuu
tegey, oo wuxuu la hadlay wadaaddada sare iyo madaxdii
askarta si uu ugu gacangeliyo. 5 Goortaasay farxeen oo
kula heshiiyeen inay lacag siiyaan, 6 wuuna oggolaaday, oo
wuxuu doonayay goor wanaagsan inuu u soo gacangeliyo
intii dadka maqnaayeen. 7 Waxaa timid maalintii Iidda
Kibista-aan-khamiirka-lahayn, tan la leeyahay in neefka
Kormaridda la gowraco. 8 Markaasaa Ciise wuxuu diray
Butros iyo Yooxanaa isagoo ku leh, Taga oo Kormaridda inoo
soo diyaargareeya aan cunnee. 9 Waxay ku yidhaahdeen,
Xaggee baad doonaysaa inaannu ku diyaargarayno? 10
Wuxuu ku yidhi, Bal eega, goortaad magaalada gashaan
waxaa idinla kulmi doona nin ashuun biyah sita. Isaga raaca
oo ka daba gala guriguu galo. 11 Waxaad ninka guriga leh
ku tidhaahdaan, Macallinkii wuxuu kugu leeyahay, Meeday
qooladdii martidu oo aan xertayda kula cuni doono cashada
Iidda Kormaridda? 12 Wuxuu idin tusayaa qoolad weyn oo
sare oo goglan, halkaa ku diyaargareeya. 13 Markaasay
tageen, oo waxay heleen siduu u sheegay, oo cashada
Iidda Kormaridda way diyaargareeyeen. 14 Goortii saacaddii
timid ayuu fadhiistay, isaga iyo rasuulladiiba. 15 Markaasuu
wuxuu ku yidhi, Aad baan u doonayay inaan cashadan Iidda
Kormaridda idinla cuno intaanan xanuunsan. 16 Waayo,
waxaan idinku leeyahay, Mar dambe tan ma cuni doono
ilaa ay ku dhammaystiranto boqortooyada Ilaah dhexdeeda.
17 Markaasuu koob qaaday, oo goortuu mahadnaqay ayuu
yidhi, Kan qaata oo qaybsada, 18 waayo, waxaan idinku
leeyahay, Hadda dabadeed anigu midhaha geedka canabka
ah kama cabbi doono ilaa ay boqortooyada Ilaah timaado.
19 Kibisna wuu qaaday, oo goortuu mahadnaqay, ayuu kala
jejebiyey, oo iyaga siiyey, isagoo leh, Tanu waa jidhkaygii
laydiin bixiyey. Waxan xusuustayda u sameeya. 20 Sidaas
oo kale cashada dabadeed koobkuu qaaday isagoo leh,
Koobkanu waa axdiga cusub oo dhiiggayga aawadiin loo
daadshay, 21 laakiin eega, gacanta kan i gacangelinaya
miiskay ila saaran tahay, 22 waayo, Wiilka Aadanahu
waa baxayaa sidii loo gooyay, laakiin hoog waxaa leh
ninkaas gacangelinaya. 23 Markaasay waxay bilaabeen inay
dhexdooda isweyddiiyaan midkood waxan yeeli doona. 24
Dhexdoodana waxaa ku jirtay dood ku saabsanayd midkood
lagu tirinaya inuu ugu weyn yahay. 25 Markaasuu ku yidhi,
Quruumaha boqorradoodu ay u taliyaan iyaga, kuwa xukun
ku lehna waxaa la yidhaahdaa, Wanaagfalayaal. 26 Idinkuse
sidaas ma ahaan doontaan, laakiin kan dhexdiinna ugu
weyn, ha noqdo sida kan yar; kan u sarreeyaana, ha noqdo
sida kan adeega. 27 Waayo, kee baa weyn, ma kan cuntada
u fadhiya baa mise waa kan adeega? Miyaanu ahayn kan
cuntada u fadhiya? Aniguse sida kan adeega ayaan idiin
dhex joogaa. 28 Idinku waxaad tihiin kuwa ila sii joogay
markii lay jirrabayay. 29 Waxaan idiin yeelayaa boqortooyo
sida aabbahay iigu yeelay, 30 si aad wax uga cuntaan oo uga
cabtaan miiskayga oo boqortooyadayda ku jira, oo waxaad
ku fadhiisan doontaan carshiyo idinkoo xukumaya laba-iyo-
tobanka qolo oo Israa'iil. 31 Simoonow, Simoonow, ogow,
Shayddaanka ayaa ku doonay inuu kuu haadiyo sida sarreen,
32 laakiin waan kuu baryootamay si aanu rumaysadkaagu u

baabbi'in, adiguna goortaad hadaysantid walaalaha adkee.
33 Markaasuu wuxuu ku yidhi, Sayidow, diyaar baan u ahay
inaan kuu raaco xabsiga iyo dhimashadaba. 34 Isaguse
wuxuu ku yidhi, Waxaan kuu sheegayaa, Butrosow, maanta
diiqu ciyi maayo ilaa aad saddex kol dafirtid inaad i taqaan.
35 Wuxuuna ku yidhi, Goortaan idin diray kiishadla'aan
iyo qandila'aan iyo kabola'aan, wax ma u baahnaydeen?
Waxay yidhaahdeen, Maya, waxba. 36 Markaasuu ku yidhi,
Laakiin haddeer kii kiishad qabaa ha qaato, sidaas oo
kalena qandi ha qaato. Kii aan midna qabinna, dharkiisa
ha iibiyo, oo seef ha iibsado. 37 Waayo, waxaan idinku
leeyahay, Waa inuu igu dhammaado qorniinkan leh, Waxaa
isaga lagu tiriyey sharcilaawayaasha. Waayo, waxa igu
saabsani dhammaad bay leeyihiin. 38 Markaasay waxay
yidhaahdeen, Sayidow, bal eeg, laba seefood ayaa halkan
yaale. Wuxuu ku yidhi, Waa ku filan tahay. 39 Markaasuu
baxay oo Buur Saytuun tegey sidii caadadiisu ahayd,
xertiina waa raacday. 40 Markuu meeshii joogay ayuu ku
yidhi, Tukada inaydnaan jirrabaadda gelin. 41 Markaasuu
intii dhagax la tuuro ka durkay, wuuna jilba joogsaday
oo tukaday, 42 isagoo leh, Aabbow, haddaad doonaysid,
koobkan iga fogee, hase ahaatee, doonistaydu yaanay
noqon, taaduse ha noqoto. 43 Markaasaa waxaa samada
kaga muuqatay malaa'ig isaga xoogaynaysa. 44 Isagoo aad
u xanuunsan ayuu dadaal ku tukaday, dhididkiisuna wuxuu
noqday sida dhibicyo dhiig ah oo dhulka ku dhacaya. 45
Goortuu tukashadiisii ka soo kacay, ayuu xertii u yimid oo
wuxuu arkay iyagoo caloolxumo la hurda. 46 Markaasuu ku
yidhi, Maxaad u huruddaan? Kaca oo tukada inaydnaan
jirrabaadda gelin. 47 Intuu weli hadlayay, bal eeg, waxaa
yimid dad badan, oo kii Yuudas la odhan jiray oo laba-
iyo-tobanka ka mid ahaa ayaa hortooda socday. Wuxuuna
u soo dhowaaday Ciise inuu dhunkado. 48 Laakiin Ciise
wuxuu ku yidhi, Yuudasow, ma waxaad Wiilka Aadanaha ku
gacangelinaysaa dhunkasho? 49 Kuwii ag joogay goortay
garteen waxa dhici doona, waxay yidhaahdeen, Sayidow,
seef miyaannu ku dhufannaa? 50 Markaasaa midkood wuxuu
ku dhuftay wadaadka sare addoonkiisii, oo dhegta midigta
ka gooyay. 51 Laakiin Ciise ayaa u jawaabay oo ku yidhi,
Sii daaya. Markaasuu dhegtiisa taabtay oo bogsiiyey. 52
Kuwa u yimid, waxa weeye, wadaaddadii sare, iyo madaxdii
askarta oo macbudka, iyo waayeelladii, waxaa Ciise ku
yidhi, Ma waxaad iila soo baxdeen seefo iyo ulo sidaan
tuug ahay? 53 Goortaan maalin walba macbudka idinkula
jiri jiray, gacmo iguma aydaan soo taagi jirin, laakiin tanu
waa saacaddiinna iyo xoogga gudcurka. 54 Markaasay isagii
qabteen oo kaxeeyeen, oo wadaadkii sare gurigiisa ayay
geliyeen. Laakiin Butros baa meel fog ka daba socday, 55 oo
goortay barxadda dhexdeeda dab ka shideen, oo ay wada
fadhiisteen, ayaa Butros dhexdooda fadhiistay. 56 Laakiin
gabadh baa intay aragtay isagoo dabka iftiinkiisa fadhiya,
aad bay u dayday oo tidhi, Kanuna waa la jiray isagii. 57
Isaguse waa dafiray oo ku yidhi, Naag yahay, anigu garanba
maayo isagii. 58 Waxoogaa yar dabadeed qof kale ayaa
arkay oo yidhi, Adiguna midkood baad tahay. Butros baase
yidhi, Nin yahow, anigu ma ihi. 59 Goortii saacad dhaaftay
mid kale ayaa adkeeyey isagoo leh, Run weeye, kanuna
waa la jiray, waayo, waa reer Galili. 60 Laakiin Butros wuxuu
ku yidhi, Nin yahow, anigu garan maayo waxaad leedahay.
Kolkiiba intuu weli hadlayay, diiqii baa ciyey. 61 Markaasaa
Rabbigu soo jeestay oo Butros eegay; Butrosna wuxuu
xusuustay ereygii Rabbiga siduu ku yidhi, Maanta intaanu
diiqu ciyin, saddex kol ayaad i dafiri doontaa. 62 Markaasuu
dibadda u baxay oo aad u ooyay. 63 Nimankii Ciise qabtay
way ku kajameen oo garaaceen. 64 Oo intay indhaha ka
xidheen ayay weyddiiyeen oo ku yidhaahdeen, Noo sheeg,
yuu yahay kan kugu dhuftay? 65 Wax badan oo kalena ayay
ku lahaayeen iyagoo caayaya. 66 Kolkuu waagii beryay,
waxaa ururay waayeelladii dadka oo ahaa wadaaddadii sare
iyo culimmadiiba, oo waxay isagii geeyeen shirkoodii iyagoo
leh, 67 Haddii aad Masiixa tahay, noo sheeg. Wuxuuse
ku yidhi, Haddaan idiin sheego ma rumaysan doontaan.
68 Haddaan idin weyddiiyona, iima jawaabi doontaan. 69
Laakiin hadda dabadeed Wiilka Aadanahu wuxuu fadhiisan
doonaa midigta xoogga Ilaah. 70 Markaasay waxay wada
yidhaahdeen, Haddaba miyaad tahay Wiilka Ilaah? Wuxuu
ku yidhi, Waad tidhaahdeen inaan ahay. 71 Markaasay
yidhaahdeen, Maxaannu markhaati weli ugu baahan nahay?
Waayo, qudheenna ayaa afkiisa ka maqalnay.

**23** Markaasaa dadkoodii oo dhan kacay, oo waxay isagii
hor geeyeen Bilaatos. 2 Kolkaasay bilaabeen inay ku
ashtakeeyaan iyagoo leh, Waxaannu aragnay ninkan oo
quruuntayada rogaya, oo diidaya in Kaysar cashuur la siiyo,
oo odhanaya inuu qudhiisu yahay Masiix oo boqor ah. 3
Bilaatos ayaa weyddiiyey, isagoo leh, Ma Boqorka Yuhuudda
baad tahay? Wuu u jawaabay oo ku yidhi, Waad tidhi. 4
Dabadeed Bilaatos wuxuu wadaaddadii sare iyo dadkii ku
yidhi, Anigu ninkan eed kuma aan helin. 5 Laakiin way ku sii
adkeeyeen iyagoo leh, Dadkuu kiciyaa, oo dalka Yahuudiya
oo dhan ayuu wax baraa; dalka Galili ayuu ka soo bilaabay
ilaa halkan. 6 Bilaatos goortuu maqlay, wuxuu weyddiiyey
inuu ninku reer Galili yahay. 7 Goortuu ogaaday inuu ka mid
ahaa kuwii Herodos xukumo, wuxuu u diray Herodos, kan

qudhiisu Yeruusaalem joogay wakhtigaas. 8 Herodos goortuu
Ciise arkay, aad buu u farxay, maxaa yeelay, ilaa wakhti
dheer ayuu doonayay inuu arko, waayo, wax buu ka maqlay,
oo wuxuu rajaynayay inuu calaamo ka arko. 9 Markaasuu
su'aalo badan weyddiiyey, laakiin waxba uma uu jawaabin.
10 Wadaaddadii sare iyo culimmadii ayaa istaagay, oo aad
iyo aad bay u ashtakeeyeen. 11 Herodos ayaa fududaystay
oo ku majaajilooday, isaga iyo askartiisiiba, oo intuu dhar
dhalaalaya u geliyey ayuu Bilaatos u celiyey. 12 Maalintaas
qudheeda Herodos iyo Bilaatos saaxiibbo bay noqdeen, intii
ka horraysayse cadaawe bay isu ahaayeen. 13 Bilaatos
ayaa isugu yeedhay wadaaddadii sare iyo taliyayaashii iyo
dadkii. 14 Markaasuu wuxuu ku yidhi, Ninkan waxaad iigu
keenteen sidii mid dadka rogaya. Bal ogaada, hortiinna
ayaan wax ku weyddiiyey, oo ninkan kuma aan helin eed
ku saabsan waxaad ku ashtakaynaysaan. 15 Herodosna
kuma uu helin, wuuna noo soo celiyey, oo ma jiro wax
dhimasho istaahila oo uu sameeyey. 16 Taas aawadeed
waan edbinayaa oo sii daynayaa. 17 Waayo, waajib bay
ahayd inuu iidda mid u sii daayo iyaga. 18 Markaasay wada
qayliyeen, iyagoo leh, Wad kan, Baraabbas noo sii daa, 19
kan xabsiga loogu riday fallaagaduu magaalada ka riday
iyo dilid aawadeed. 20 Mar kale Bilaatos ayaa iyaga la
hadlay isagoo doonaya inuu Ciise sii daayo. 21 Laakiin way
qayliyeen, iyagoo leh, Iskutallaabta ku qodob, iskutallaabta
ku qodob. 22 Markaasuu wuxuu kolkii saddexaad ku yidhi,
Waayo? Waa maxay sharka kanu sameeyey? Kuma aan
helin sabab lagu dilo, taas aawadeed waan edbinayaa oo
sii daynayaa. 23 Laakiin cod weyn ayay ku adkaysteen
iyagoo weyddiisanaya in iskutallaabta lagu qodbo, oo waxaa
xoog batay codadkoodii iyo codadkii wadaaddada sare. 24
Markaasaa Bilaatos wuxuu xukumay in loo yeelo waxay
weyddiisteen. 25 Wuuna sii daayay kii fallaagada iyo dilidda
xabsiga loogu riday oo ay weyddiisteen, laakiin Ciise buu u
dhiibay iyaga siday doonayeen. 26 Kolkay wadeen, waxay
qabteen Simoon reer Kuranaya ah isagoo beeraha ka soo
socda, waxayna saareen iskutallaabtii inuu Ciise ka daba
qaado. 27 Waxaana la socday dad badan iyo dumar laabta
garaacaya oo barooranaya. 28 Laakiin Ciise intuu u soo
jeestay, wuxuu ku yidhi, Gabdhaha Yeruusaalemow, ha ii
ooyina, laakiin u ooya qudhiinna iyo carruurtiinna, 29 waayo,
bal eega, wakhtigu waa imanayaa goortay odhan doonaan,
Waxaa barakaysan madhashada iyo uurarka aan weligood
dhalin iyo naasaha aan weligood la nuugin. 30 Markaasay
bilaabi doonaan inay buuraha ku yidhaahdaan, Nagu soo
dhaca, oo ay gumburahana ku yidhaahdaan, Na qariya.
31 Waayo, hadday geedka qoyan waxaas ku sameeyaan,
maxaa ku dhici doona kan engegan? 32 Waxaana lala
waday laba kale oo xumaanfalayaal ah in lala dilo. 33
Markay yimaadeen meeshii la yidhaahda dhakada, halkaasay
iskutallaabo ku qodbeen isaga iyo xumaanfalayaashii,
mid midigta, kan kalena bidixda. 34 Markaasaa Ciise
wuxuu yidhi, Aabbow, iyaga cafi, waayo, garan maayaan
waxay samaynayaan. Markaasay dharkiisii qaybsadeen,
wayna saami riteen. 35 Dadkuna way taagnaayeen iyagoo
daawanaya. Taliyayaashuna way ku qosleen iyagoo leh,
Kuwa kale ayuu badbaadiyey, kanu ha isbadbaadiyo, hadduu
yahay Masiixa Ilaah, kan uu doortay. 36 Askartiina waa ku
majaajiloodeen, oo intay u yimaadeen, ayay khal siiyeen,
37 oo waxay ku yidhaahdeen, Haddii aad tahay boqorka
Yuhuudda, isbadbaadi. 38 Meel ka korraysay isagana waxaa
ku qorraa qorniin leh, KANU WAA BOQORKA YUHUUDDA.
39 Xumaanfalayaashii deldelnaa midkood ayaa caayay isagoo
leh, Miyaanad ahayn Masiixa? Annaga iyo qudhaadaba
badbaadi. 40 Laakiin kii kale ayaa jawaabay oo canaantay
isagoo leh, Miyaanad xataa Ilaah ka baqin, waayo, isku
xukun baad tihiin? 41 Waayo, innaga waa inoo xaq, maxaa
yeelay, waxaynu helnay abaalkii wixii aynu falnay, ninkanuse
wax aan jid ahayn ma uu falin. 42 Markaasuu ku yidhi,
Ciisow, i xusuuso goortaad boqortooyadaada ku timaado.
43 Wuxuu ku yidhi, Runtii waxaan kugu leeyahay, Maanta
Firdooska ayaad igula jiri doontaa. 44 Haddaba waxay ahayd
abbaaraha saacaddii lixaad, dhulka oo dhammuna gudcur
buu noqday ilaa saacaddii sagaalaad. 45 Qorraxdu way
madoobaatay, daahii macbudkuna dhexda ayuu ka kala
dillaacay. 46 Markaasaa Ciise cod weyn ku dhawaaqay oo
yidhi, Aabbow, gacmahaaga ayaan ruuxayga u dhiibayaa.
Goortuu waxaas yidhi, ayuu ruuxii bixiyey. 47 Boqol-u-
taliyihii goortuu arkay wixii dhacay, ayuu Ilaah ammaanay oo
yidhi, Hubaal ninkanu xaq buu ahaa. 48 Dadkii oo dhan oo
daawasho isugu yimid, goortay arkeen wixii dhacay, ayay
noqdeen iyagoo laabta garaacaya. 49 Waxaa meel fogna ka
taagnaayeen kuwii Ciise yiqiin oo dhan iyo dumarkii Galili ka
soo raacay, iyagoo waxaas dayaya. 50 Oo bal eeg, waxaa
jiray nin Yuusuf la odhan jiray oo taliye ahaa, wuxuuna
ahaa nin wanaagsan oo xaq ah, 51 (isaguna raalli kama
ahayn waanidoodii iyo falniinkoodii), wuxuuna ahaa reer
Arimataya oo ahayd magaalo Yuhuudda, kan boqortooyada
Ilaah sugayay. 52 Kanu wuxuu u tegey Bilaatos oo ka baryay
Ciise meydkiisii. 53 Markaasuu soo dejiyey oo kafan ku
duudduubay, oo wuxuu geliyey xabaal dhagax ka qodnayd,
meel aan weligeed ninna la dhigin. 54 Waxay ahayd Maalintii
Diyaargarayska, sabtidiina waa soo dhowaanaysay. 55
Dumarkii kala yimid Galili ayaa daba socday oo arkay

xabaashii iyo sida meydkiisii loo dhigay. 56 Markaasay
noqdeen, oo dhir udgoon iyo cadar soo diyargareeyeen.
Sabtidiina way nasteen sida qaynuunka u ahaa.

24 Maalintii ugu horraysay ee toddobaadka, goortii waagii
beryayay, ayay xabaashii yimaadeen, iyagoo wada
dhirtii udgoonayd oo ay diyaargareeyeen. 2 Oo waxay
arkeen dhagixii oo xabaashii laga giringiriyey. 3 Markaasay
galeen, laakiin kama ay helin meydkii Rabbi Ciise. 4 Waxaa
dhacay, intay waxaas ka sii welwelsanaayeen, in laba nin oo
dhar dhalaalaya sitaa ag taagnaayeen. 5 Dumarkii iyagoo
cabsanaya ayay wejigooda hoos ugu foororiyeen dhulka.
Markaasay ku yidhaahdeen iyaga, Maxaad kan nool uga
dhex doondoonaysaan kuwii dhintay? 6 Isagu halkan ma
joogo, laakiinse waa sara kacay. Xusuusta siduu idiinla
hadlay intuu Galili weli joogay, 7 isagoo leh, Wiilka Aadanaha
waa in loo gacangeliyo dembilayaasha, oo iskutallaabta
lagu qodbo, oo maalinta saddexaad uu soo sara kaco.
8 Markaasay hadalladiisii xusuusteen. 9 Wayna ka soo
noqdeen xabaashii, oo waxaas oo dhan ayay u sheegeen
koob-iyo-tobankii iyo kuwii kale oo dhan. 10 Waxay ahaayeen
Maryantii reer Magdala, iyo Yo'anna, iyo Maryan oo ahayd
Yacquub hooyadii; dumarkii kalena oo la jiray ayaa waxaas
rasuulladii u sheegay. 11 Hadalladaas waxay la noqdeen
wax aan micne lahayn, wayna rumaysan waayeen. 12
Laakiin Butros ayaa kacay oo xabaashii u orday, markaasuu
foororsaday oo wuxuu arkay maryihii keligood oo meel yaal;
markaasuu ka tegey oo gurigiis ku noqday isagoo ka yaabban
wixii dhacay. 13 Laba ka mid ah iyaga waxay maalintaas
qudheeda ku socdeen tuulo la odhan jiray Emma'us, tan
Yeruusaalem u jirtay lixdan istaadiyon. 14 Waxay ka wada
hadlayeen wixii dhacay oo dhan, 15 oo waxay noqotay
intay wada hadlayeen oo wax isweyweyddiinayeen, in Ciise
qudhiisa u soo dhowaaday oo la socday. 16 Laakiin waa la
indhasaabay si aanay u garanayn. 17 Markaasuu ku yidhi,
Maxay yihiin hadalladan aad isku haysaan intaad socotaan?
Wayna istaageen iyagoo fool qulubsan. 18 Midkood oo
Kale'obas la odhan jiray, ayaa u jawaabay oo ku yidhi, Ma
adigoo keliya oo Yeruusaalem deggan oo aan ogayn wixii
ayaamahan meeshaas ka dhacay? 19 Wuxuu ku yidhi, Wax
maxay ah? Waxay ku yidhaahdeen, Wixii ku saabsanaa
Ciisihii Reer Naasared, kii ahaa nin nebi ah oo xoog u lahaa
wax falniin iyo hadal ah Ilaah iyo dadka oo dhan hortooda, 20
iyo sidii wadaaddada sare iyo taliyayaasheennii ugu dhiibeen
in dhimasho lagu xukumo, oo iskutallaabta ayay ku qodbeen.
21 Laakiin waxaannu rajaynaynay inuu yahay kan Israa'iil
soo furan lahaa, laakiin waxaas oo dhan weliba maanta
waa u maalintii saddexaad markii ay waxaas oo dhammi
dhaceen. 22 Weliba dumar annaga naga mid ah ayaa naga
yaabsiiyey, kuwii aroortii hore xabaashii tegey. 23 Goortii ay
meydkiisii waayeen ayay yimaadeen iyagoo leh, Waxaannu
weliba aragnay muuqad malaa'igo kuwa yidhi, Wuu nool
yahay. 24 Qaarkood oo nala joogay ayaa xabaashii tegey,
oo waxay arkeen sidii dumarku yidhi, laakiin isagase ma ay
arkin. 25 Markaasuu ku yidhi, Nacasyo yahow oo qalbigoodu
ka raagay inuu rumaysto wixii nebiyada oo dhammi ay ka
hadleen. 26 Masiixa miyaanay waajib ku ahayn inuu waxaas
oo dhan ku silco oo uu ammaantiisa galo? 27 Markaasuu ka
bilaabay Muuse iyo nebiyada oo dhan, Qorniinka oo dhanna
ayuu uga micneeyey wixii isaga qudhiisa ku saabsanaa.
28 Goortaasay ku soo dhowaadeen tuuladay ku socdeen,
isaguna wuxuu iska dhigay mid sii fogaanaya, 29 laakiin way
oggolaysiiyeen iyagoo leh, Nala joog, waayo, makhribku
waa dhow yahay, maalintiina durba waa dhammaatay.
Markaasuu la galay inuu la joogo. 30 Waxaa dhacay kolkuu
cunto ula fadhiistay inuu kibista qaaday, oo barakeeyey, oo
intuu kala jejebiyey ayuu siiyey. 31 Markaasaa indhahoodu
furmeen, oo isagay garteen, wuuna ka libdhay. 32 Markaasay
isku yidhaahdeen, Miyaan qalbigeennu gubanin intuu jidka
inagula hadlayay iyo intuu Qorniinkii inoo furayay? 33
Saacaddaas qudheeda ayay kaceen oo Yeruusaalem ku
noqdeen, waxayna arkeen koob-iyo-tobankii iyo kuwii la
jiray oo isu ururay, 34 iyagoo leh, Hubaal Sayidku waa sara
kacay, oo wuxuu u muuqday Simoon. 35 Iyaguna waxay ka
warrameen wixii jidka ka dhacay iyo siday isaga ugu garteen
kala jejebintii kibista. 36 Intay waxyaalahaas ku hadlayeen,
isaga qudhiisa ayaa dhexdooda taagnaa, oo wuxuu ku
yidhi, Nabadi ha idinla jirto. 37 Laakiin way argaggexeen oo
cabsadeen, waxayna u maleeyeen inay ruuxaan arkeen. 38
Markaasuu ku yidhi, Maxaad u naxaysaan? Fikirro maxay
qalbigiinna uga kacayaan? 39 Gacmahayga iyo cagahayga
arka inaan anigu isagii ahay, i taabta oo arka, waayo,
ruuxaan jiidh iyo lafo ma leh sidaad igu arkaysaan inaan
leeyahay. 40 Goortuu waxaas yidhi, ayuu tusay gacmihiisa
iyo cagihiisa. 41 Intay yaabsanaayeen iyagoo aan weli
rumaysan farxad aawadeed, wuxuu ku yidhi, Halkan wax la
cuno ma ku haysaan? 42 Kolkaasay waxay siiyeen in kalluun
duban ah. 43 Markaasuu qaaday oo hortooda ku cunay.
44 Wuxuu ku yidhi, Kuwani waa hadalladaydii aan idinkula
hadlay intii aan weli idinla jiray. Waa inay noqdaan wax walba
oo sharciga Muuse iyo nebiyadii iyo sabuurrada laygaga
qoray oo igu saabsanaa. 45 Markaasuu garashadooda
u furay si ay u gartaan Qorniinka. 46 Wuxuuna ku yidhi,
Sidaasay u qoran tahay, Waa inuu Masiixu silco, oo uu

maalinta saddexaad kuwa dhintay ka soo sara kaco, 47
iyo in toobaddii iyo dembidhaafka magiciisa lagu wacdiyo
quruumaha oo dhan oo laga bilaabo Yeruusaalem. 48
Idinkuna waxyaalahaas ayaad markhaati ka tihiin. 49 Oo bal
eega, waxaan idiin soo dirayaa ballankii Aabbahay, laakiin
magaalada jooga ilaa xoog laydinka huwiyo xagga sare. 50
Markaasuu iyaga kaxeeyey ilaa meel ku dhow Beytaniya, oo
intuu gacmihii kor u qaaday ayuu barakeeyey. 51 Waxaa
dhacay intuu barakaynayay inuu ka tegey, oo waxaa kor
loogu qaaday samada. 52 Markaasay isaga caabudeen, oo
waxay Yeruusaalem kula noqdeen farxad weyn; 53 oo goor
walbaba macbudka ayay ku jireen iyagoo Ilaah ammaanaya.

# Yooxanaa

1 Bilowgii waxaa jiray Ereyga, Ereyguna wuxuu la jiray
Ilaah, Ereyguna wuxuu ahaa Ilaah. 2 Isagu Ilaah buu la
jiray bilowgii. 3 Wax walba waxaa laga sameeyey xaggiisa,
oo wixii la sameeyey lama samayn isaga la'aantiis. 4
Isaga waxaa ku jirtay nolol, noloshuna waxay ahayd nuurka
dadka. 5 Nuurkuna wuxuu ka ifayaa gudcurka, gudcurkuna
kama badin. 6 Waxaa jiray nin xagga Ilaah laga soo diray,
magiciisuna wuxuu ahaa Yooxanaa. 7 Isagu wuxuu u yimid
markhaati furid, inuu u marag furo nuurka, inay dhammaan
xaggiisa ka wada rumaystaan. 8 Isagu nuurka ma uu ahayn,
laakiin wuxuu u yimid inuu nuurka u marag furo. 9 Kaasu
wuxuu ahaa nuurka runta ah oo iftiimiya nin walba oo dunida
yimaada. 10 Wuxuu ku jiray dunida, dunidana waxaa laga
sameeyey xaggiisa, oo duniduna ma ay garanayn isaga.
11 Wuxuu u yimid kuwiisii, kuwiisiina ma ay aqbalin isaga.
12 Laakiin in alla intii aqbashay, wuxuu siiyey amar ay
carruurtii Ilaah ku noqdaan, kuwaasu waa kuwii magiciisa
rumaystay, 13 oo aan ka dhalan dhiigga, ama doonistii
jidhka, ama dad doonistiis, laakiin waxay ka dhasheen Ilaah.
14 Ereyguna jidh buu noqday, oo waa ina dhex joogay, oo
waxaannu aragnay ammaantiisii, taas oo ahayd ammaantii u
ekayd tan Wiilka keliya ee Aabbaha, ee nimco iyo run ka
buuxa. 15 Yooxanaa waa u marag furay isaga, wuxuuna
ku qayliyey oo yidhi, Kanu waa kii aan idhi, Kan iga daba
imanayaa waa iga horreeyey, waayo, hortay buu jiray. 16
Dhammaanteen waxaynu buuxnaantiisa ka helnay nimco ka
nimco. 17 Waayo, sharciga waxaa loo soo dhiibay Muuse,
laakiinse nimcada iyo runtu waxay ku yimaadeen Ciise
Masiix. 18 Ninna ma arkin Ilaah marnaba, Wiilka keliya oo
laabta Aabbaha ku jira kaasaa inoo sheegay. 19 Kanu waa
maraggii Yooxanaa furay, markii Yuhuuddu Yeruusaalem
uga soo direen wadaaddo iyo kuwo reer Laawi ah inay
weyddiiyaan oo ku yidhaahdaan, Yaad tahay? 20 Isagu
waa qirtay, mana uu inkirin, oo wuxuu qirtay oo yidhi, Anigu
ma ihi Masiixa. 21 Markaasay weyddiiyeen, Haddaba yaad
tahay? Ma Eliyaas baad tahay? Wuxuuna yidhi, Ma ihi. Ma
nebigii baad tahay? Wuxuuna ku jawaabay, Maya. 22 Waxay
haddaba ku yidhaahdeen, Yaad tahay? si aannu jawaab ugu
celinno kuwii na soo diray. Yaad isku sheegaysaa? 23 Wuxuu
yidhi, Waxaan ahay codka kan cidlada kaga qaylinaya, Jidka
Rabbiga toosiya, siduu nebi Isayos u yidhi. 24 Kuwa la
soo diray waxay ka yimaadeen Farrisiinta. 25 Markaasay
weyddiiyeen oo ku yidhaahdeen, Haddaba maxaad dadka
u baabtiistaa haddaanad ahayn Masiixa ama Eliyaas ama
nebigii? 26 Yooxanaa wuxuu ugu jawaabay oo ku yidhi,
Anigu waxaan dadka ku baabtiisaa biyo, laakiin dhexdiinna
waxaa jooga mid aydnaan garanaynin 27 oo ah kan iga daba
imanaya, kan aanan istaahilin inaan yeelmaha kabtiisa furo.
28 Waxyaalahaasu waxay ka dhaceen Beytaniya taas oo ku
taal Webi Urdun shishadiisa, oo ahayd meeshii Yooxanaa
dadka ku baabtiisayay. 29 Maalintii labaad Yooxanaa wuxuu
arkay Ciise oo ku soo socda, oo wuxuu yidhi, Bal eega
Wanka Ilaah ee dembiga dunida qaadaya. 30 Kanu waa
kii aan idhi, Waxaa iga daba imanaya nin iga horreeyey,
waayo, hortay buu jiray. 31 Anigu ma aan aqoonin isaga,
laakiin inuu Israa'iil u soo muuqdo sidaa daraaddeed ayaan
u imid anigoo dadka biyo ku baabtiisa. 32 Yooxanaa waa
marag furay isagoo leh, Waxaan arkay Ruuxa oo samada
uga soo degaya sidii qoolley oo kale, wuuna dul joogsaday
isagii. 33 Anigu ma aan aqoonin isaga, laakiin kii ii soo diray
inaan dadka biyo ku baabtiiso, wuxuu igu yidhi, Kii aad ku
aragtid Ruuxa oo ku soo degaya oo ku dul joogsanaya,
kaasu waa kan dadka ku baabtiisa Ruuxa Quduuska ah.
34 Anigu waan arkay, waana u marag furay in kanu yahay
Wiilka Ilaah. 35 Mar kale maalintii dambe Yooxanaa waa
taagnaa isaga iyo laba xertiisa ahayd. 36 Oo wuxuu arkay
Ciise oo socda, markaasuu yidhi, Bal eega Wanka Ilaah.
37 Labadii xerta ahaydna way maqleen isagoo hadlaya,
wayna raaceen Ciise. 38 Markaasaa Ciise soo jeestay,
waana arkay iyagoo raacaya, kolkaasuu ku yidhi, Maxaad
doonaysaan? Waxay ku yidhaahdeen, Rabbi (waxaa lagu
fasiraa Macallin), Xaggee baad deggan tahay? 39 Wuxuu ku
yidhi, Kaalaya oo arka, Markaasay yimaadeen oo arkeen
meeshuu degganaa, wayna la joogeen maalintaas. Goortaas
waxay ahayd abbaaraha saacaddii tobnaad. 40 Mid ka
mid ah labadii maqashay Yooxanaa oo raacday, wuxuu
ahaa Andaros, Simoon Butros walaalkiis. 41 Isagu wuxuu
hortii doonay walaalkiis Simoon oo ku yidhi, Waannu helnay
Masiixa (kan lagu fasiro Kiristooska). 42 Markaasuu wuxuu u
geeyey Ciise. Ciisena intuu eegay ayuu wuxuu ku yidhi,
Adigu waxaad tahay Simoon ina Yoonis. Waxaa lagu odhan
doonaa Keeyfas (oo fasirkiisu yahay Butros). 43 Maalintii
labaad wuxuu doonayay inuu Galili tago, oo wuxuu helay
Filibos. Ciisena wuxuu ku yidhi, I soo raac. 44 Filibos wuxuu
ahaa reer Beytsayda taas oo ah magaaladii Andaros iyo
Butros. 45 Markaasaa Filibos wuxuu doonay Nataana'el oo
ku yidhi, Waxaannu helnay kii Muuse sharciga ku qoray wax
isaga ku saabsan, oo nebiyadiina ay qoreen wax isaga ku
saabsan, waana Ciisihii reer Naasared oo ah ina Yuusuf. 46
Nataana'el wuxuu ku yidhi, Ma wax wanaagsan baa ka iman
kara Naasared? Markaasaa Filibos wuxuu ku yidhi, Kaalay
oo arag. 47 Ciise wuxuu arkay Nataana'el oo ku soo socda,

oo wuxuu ku yidhi, Bal eeg, kanu waa mid reer Israa'iil oo run
ah oo aan khiyaano lahayn. 48 Markaasaa Nataana'el wuxuu
ku yidhi, Xaggee baad igu tiqiin? Ciise ayaa u jawaabay
oo ku yidhi, Intaan Filibos kuu yeedhin, markaad geedkii
berdaha hoostiisa joogtay, ayaan ku arkay. 49 Kolkaasaa
Nataana'el u jawaabay oo ku yidhi, Macallimow, waxaad
tahay Wiilka Ilaah, oo waxaad tahay boqorkii Israa'iil. 50
Ciise ayaa u jawaabay oo ku yidhi, Ma waxaad u rumaysatay
odhaatinkii aan kugu idhi, Geedka berdaha hoostiisa ayaan
kugu arkay? Waxaad arki doontaa wax waxyaalahaas ka
waaweyn. 51 Markaasuu ku yidhi, Runtii, runtii, waxaan
idinku leeyahay, Waxaad arki doontaan samadoo furan iyo
malaa'igaha Ilaah oo kor u kacaya oo ku soo degaya Wiilka
Aadanaha.

2 Maalintii saddexaad waxaa Kaana tii Galili jiray aroos,
Ciise hooyadiisna halkaasay joogtay. 2 Waxaana arooska
loogu yeedhay Ciise iyo xertiisii. 3 Markii khamrigu
dhammaaday Ciise hooyadiis waxay isaga ku tidhi, Khamri
ma ay qabaan. 4 Markaasaa Ciise wuxuu iyada ku yidhi,
Islaan yahay, aniga iyo adiga maxaa inoo dhexeeya?
Saacaddaydu weli ma iman. 5 Kolkaasaa hooyadiis waxay
midiidinyadii ku tidhi, Wax kastuu idinku yidhaahdo, yeela.
6 Meeshaas waxaa yiil lix ashuun oo dhagax ah, oo loo
dhigay caadada Yuhuudda oo daahirinta, mid kastaana
wuxuu qaadi jiray qiyaas laba ama saddex metritas. 7
Markaasaa Ciise wuxuu ku yidhi, Ashuummada biyo ka
buuxiya, goortaasay buuxiyeen ilaa girgirka. 8 Kolkaasuu
wuxuu ku yidhi, Ka soo dhura oo u geeya ka miiska arooska
madaxda u ah, wayna u geeyeen. 9 Kii madaxda ahaa
markuu dhadhamiyey biyihii khamriga noqday ma uu ogayn
meel ay ka yimaadeen, laakiin midiidinyadii oo soo dhuray
way ogaayeen; markaasaa kii madaxda ahaa u yeedhay
ninkii arooska ahaa, 10 oo ku yidhi, Nin kastaa marka
hore wuxuu soo saaraa khamriga wanaagsan, oo markay u
cabbaan siday doonayaan dabadeedna ayuu keenaa kan
liita; adiguse khamriga wanaagsan ilaa haddeer ayaad dib u
dhigtay. 11 Calaamooyinka Ciise tii ugu horraysay waxay
ahayd tan uu ku sameeyey Kaana tii Galili, oo wuxuu ku
muujiyey ammaantiisii, xertiisiina way rumaysteen. 12 Waxaas
dabadeed wuxuu tegey Kafarna'um, waxaana la socday
hooyadiis iyo walaalihiis iyo xertiisii, oo maalmo aan badnayn
ayay meeshaas joogeen. 13 Iiddii Kormaridda oo Yuhuudda
waa dhowayd, oo Ciisena wuxuu u kacay Yeruusaalem. 14
Wuxuu macbudka ku arkay kuwa ku iibinaya dibiyo iyo ido
iyo qoolleyo, iyo kuwa fadhiya oo lacagta bedbeddelaya. 15
Markaasuu xadhko karbaash ka sameeyey, kulligoodna ayuu
macbudka ka eryay, dibiyada iyo idaha labadaba, lacagtiina
wuu ka daadiyey kuwii bedbeddelayay, miisaskoodiina wuu
rogay. 16 Kuwii qoolleyaha iibinayayna wuxuu ku yidhi,
Waxyaalahan halkan ka qaada. Guriga Aabbahay ha ka
dhigina guri baayacmushtari. 17 Xertiisii waxay xusuusteen
in la qoray. Qiiradaan gurigaaga u qabo ayaa i gubaysa. 18
Sidaa aawadeed Yuhuuddu waa u jawaabtay oo ku tidhi
isaga, Calaamadee baad na tusaysaa waxaad waxyaalahaas
u samaynayso? 19 Ciisena waa u jawaabay oo ku yidhi,
Macbudkan dumiya, oo saddex maalmood dabadeed ayaan
kicin doonaa. 20 Yuhuuddu haddaba waxay yidhaahdeen,
Lix iyo afartan sannadood ayaa macbudkan la dhisayay,
adiguna ma waxaad ku kicinaysaa saddex maalmood? 21
Isaguse wuxuu ka hadlayay macbudka jidhkiisa ah. 22 Sidaa
aawadeed markuu ka soo sara kacay kuwii dhintay, xertiisii
way soo xusuusteen inuu taas ka hadlay, wayna rumaysteen
Qorniinka iyo hadalkii Ciise yidhi. 23 Markuu Yeruusaalem
joogay wakhtigii Iiddii Kormaridda dad badan ayaa magiciisa
rumaystay markay arkeen calaamooyinkuu sameeyey. 24
Laakiin Ciise qudhiisu iskuma hallayn iyaga, waayo dadka
oo dhan ayuu yiqiin, 25 oo uma baahnayn in laga marag furo
dadka, waayo, isaga qudhiisu waa yiqiin waxa dadka ku jira.

3 Waxaa jiray nin ka mid ahaa Farrisiinta oo la odhan
jiray Nikodemos oo Yuhuudda taliye u ahaa. 2 Isagu
habeenkuu u yimid Ciise, wuxuuna ku yidhi, Macallimow,
waannu og nahay inaad tahay macallin ka yimid Ilaah,
waayo, ninna ma samayn karo calaamooyinkan aad samayso
haddaan Ilaah la jirin. 3 Ciise ayaa u jawaabay oo ku yidhi,
Runtii, runtii waxaan kugu leeyahay, Qof haddaanu mar kale
dhalan, boqortooyadii Ilaah arki kari maayo. 4 Nikodemos
wuxuu ku yidhi, Sidee baa nin mar kale u dhalan karaa
isagoo duq ah? Miyuu mar kale uurkii hooyadiis geli karaa
oo ka dhalan karaa? 5 Ciise baa ugu jawaabay, Runtii,
runtii, waxaan kugu leeyahay, Qof haddaanu ka dhalan biyo
iyo Ruuxa, boqortooyadii Ilaah geli kari maayo. 6 Waxa
jidhka ka dhashaa waa jidh, waxa Ruuxa ka dhashaana
waa ruux. 7 Ha la yaabin haddaan ku leeyahay, Waa inaad
mar kale dhalataan. 8 Dabayshu way u dhacdaa meeshay
doonto, waxaadna maqashaa xiinkeeda, laakiin ma ogid
meeshay ka timaado iyo meeshay u kacdo; waa sidaas
oo kale qof kasta oo Ruuxa ka dhasha. 9 Nikodemos
ayaa u jawaabay oo ku yidhi, Sidee baa waxyaalahaas
u noqon karaan? 10 Markaasaa Ciise u jawaabay oo ku
yidhi, Ma waxaad tahay macallinka Israa'iil, oo aadan weliba
waxyaalahaasna garanayn? 11 Runtii, runtii, waxaan ku
leeyahay, Waxaannu naqaan ayaannu ka hadalnaa, oo
waxaannu aragnay ayaannu ka marag furnaa, idinkuna

maraggayaga ma aqbashaan. 12 Haddaan wixii dunida
idiin sheegay oo aad rumaysan weydeen, sidee baad u
rumaysanaysaan haddaan waxa jannada idiin sheego? 13
Ninna jannada kor uma tegin, kii jannada ka soo degay
maahee, waana Wiilka Aadanaha oo jannada jooga. 14
Sidii Muuse abeesadii kor ugu qaaday cidlada, sidaasoo
kale Wiilka Aadanaha waa in kor loo qaado, 15 in mid
kastoo isaga rumaystaa uu lahaado nolosha weligeed ah.
**(aiōnios g166)** 16 Ilaah intuu dunida jacayl u qabay ayuu siiyey
Wiilkiisa keliya oo dhashay in mid kastoo isaga rumaystaa
uusan lumin laakiinse uu lahaado nolosha weligeed ah.
**(aiōnios g166)** 17 Ilaah Wiilka uguma soo dirin dunida inuu
xukumo dunida, laakiin wuxuu u soo diray inay dunidu ku
badbaaddo isaga. 18 Kii isaga rumaystaa ma xukumna,
laakiinse kii aan isaga rumaysan, hore ayaa loo xukumay,
maxaa yeelay, wuxuusan rumaysan magaca Wiilka Ilaah
oo keliya oo dhashay. 19 Kanu waa xukunka, nuurka ayaa
dunida yimid, dadkiise waxay nuurkii ka jeclaadeen gudcurka,
maxaa yeelay, shuqulladoodu shar bay ahaayeen. 20 Nin
kastoo shar falaa nuurkuu nebcaadaa, umana yimaado
nuurka, si aan shuqulladiisa loogu canaanan. 21 Laakiinse kii
runta falaa, nuurkuu yimaadaa si shuqulladiisu u muuqdaan
in Ilaah laga sameeyey. 22 Waxaas dabadeed Ciise iyo
xertiisii waxay yimaadeen dalka Yahuudiya, oo meeshaas
ayuu iyaga la joogay oo dad ku baabtiisay. 23 Yooxanaana
wuxuu dad ku baabtiisayay Caynoon oo ku dhow Saalim,
waayo, meeshaasu waxay lahayd biyo badan, iyaguna way
yimaadeen, waana la baabtiisay. 24 Waayo, Yooxanaa weli
xabsiga laguma tuurin. 25 Sidaa aawadeed waxaa ka dhex
kacay Yooxanaa xertiisii iyo nin Yuhuudi ahaa weyddiis oo
daahirinta ku saabsan. 26 Markaasay u yimaadeen Yooxanaa
oo ku yidhaahdeen, Macallimow, kii kula jiray Webi Urdun
shishadiisa oo aad marag u furtay ayaa dad baabtiisaya,
oo dadka oo dhan way u imanayaan. 27 Yooxanaa waa u
jawaabay oo ku yidhi, Ninna waxba ma heli karo haddaan
jannada laga siin. 28 Idinka qudhiinnu markhaatiyaal baad
tihiin inaan idhi, Anigu ma ihi Masiixa, laakiin hortiisa ayaa
lay soo diray. 29 Kii aroosadda qabaa waa arooska, laakiin
saaxiibka arooska oo ag taagan oo maqla isaga, aad buu
ugu farxaa codkii arooska daraaddiis. Sidaa aawadeed
farxaddaydu waa dhan tahay. 30 Isagu waa inuu kordho,
aniguse waa inaan yaraado. 31 Kii xagga sare ka yimaadaa,
dhammaan ayuu ka sarreeyaa; kii dunida ka yimaadaana
waa kii dunida, oo wuxuu ka hadlaa dunida. Kii jannada ka
yimaadaa, dhammaan ayuu ka sarreeyaa. 32 Wuxuu arkay
oo maqlay waxaas ayuu ka marag furaa, ninnana maraggiisa
ma aqbalo. 33 Kii maraggiisa aqbalay wuxuu xaqiijiyey in
Ilaah run yahay. 34 Waayo, kii Ilaah soo diray ayaa ereygii
Ilaah ku hadla, maxaa yeelay, isagu qiyaas kuma siiyo
Ruuxa. 35 Aabbuhu wuu jecel yahay Wiilka, oo wax walba
ayuu gacanta u geliyey. 36 Kii Wiilka rumaystaa, wuxuu
leeyahay nolosha weligeed ah, kii aan Wiilka rumaysanse,
nolosha ma arki doono, laakiin cadhadii Ilaah ayaa ku taal
isaga. **(aiōnios g166)**

**4** Kolkii Ciise ogaaday inay Farrisiintu maqleen inuu
yeelanayay oo baabtiisayay xer ka badan intii Yooxanaa 2
(in kastoo Ciise qudhiisu uusan baabtiisin, laakiin xertiisu way
baabtiisayeen), 3 ayuu Yuhuudiya ka tegey, wuxuuna mar
kale u kacay Galili. 4 Oo wuxuu lahaa inuu Samaariya dhex
maro. 5 Haddaba wuxuu yimid magaalada Samaariya, oo
Sukhar la odhan jiray, oo ku dhowayd dalkii Yacquub siiyey
wiilkiisii Yuusuf. 6 Waxaana meeshaas jiray ceelkii Yacquub.
Haddaba Ciise oo sodcaal ku soo daalay, wuxuu fadhiistay
ceelka agtiisa. Saacaddiina waxay ku qiyaasnayd lixda. 7
Markaasaa waxaa timid naag reer Samaariya ah inay biyo
dhaansato. Kolkaasaa Ciise wuxuu ku yidhi iyada, I waraabi.
8 Maxaa yeelay, xertiisii magaaladay ku maqnaayeen inay
cunto soo iibsadaan. 9 Naagtii reer Samaariya ahayd waxay
haddaba ku tidhi isaga, Sidee baad, adigoo Yuhuudi ah,
biyo ii weyddiisanaysaa, anigoo naag reer Samaariya ah?
(Waayo, dan iskuma leh Yuhuudda iyo reer Samaariya.) 10
Ciise waa u jawaabay oo ku yidhi iyada, Haddaad garanaysid
hadiyaddii Ilaah iyo kuu yahay kan kugu leh, I waraabi,
adigu waad weyddiisan lahayd isaga, oo wuxuu ku siin
lahaa biyaha nool. 11 Naagtii waxay ku tidhi, Sayidow,
waxaad biyo ku dhaansato ma haysatid, ceelkuna wuu dheer
yahay. Haddaba xaggee baad ka helaysaa biyaha nool? 12
Miyaad ka weyn tahay awowahayagii Yacquub oo ceelka
na siiyey oo isaga qudhiisu ka cabbay iyo wiilashiisii iyo
xoolihiisuba? 13 Ciise ayaa u jawaabay oo ku yidhi iyada,
Kii kasta oo biyahan ka cabbaa, mar kale wuu harraadi
doonaa, 14 laakiin ku alla kii ka cabba biyahaan siin doono,
weligiis ma harraadi doono, laakiin biyahaan siin doono
waxay gudihiisa ku noqon doonaan il biyo ka duulayaan tan
iyo nolosha weligeed ah. **(aiōn g165, aiōnios g166)** 15 Naagtii
waxay ku tidhi, Sayidow, biyahan i sii inaanan haddana
harraadin oo aanan halkan iman inaan ka dhaansado. 16
Markaasaa Ciise wuxuu ku yidhi, Tag oo ninkaagii u soo
yeedh, oo halkan kaalay. 17 Naagtii ayaa u jawaabtay oo
ku tidhi, Nin ma lihi. Ciise wuxuu ku yidhi, Run baad ku
hadashay, Nin ma lihi. 18 Waayo, shan nin baad lahayd,
kan aad haddeer haysatidna ninkaagii ma aha. Taas run
baad ku sheegtay. 19 Naagtii waxay ku tidhi, Sayidow, waan

gartay inaad nebi tahay. **20** Awowayaashayo buurtan ayay ku
caabudi jireen, idinkuse waxaad tidhaahdaan, Yeruusaalem
waa meeshii la leeyahay in lagu caabudo. **21** Markaasaa
Ciise wuxuu ku yidhi, Naag yahay, i rumee, saacaddu waa
imanaysaa markii aydnaan Aabbaha ku caabudi doonin
ama buurtan ama Yeruusaalem midnaba. **22** Idinku waxaad
caabuddaan waxaydnaan oqoon, annaguse waxaannu
caabudnaa waxaannu naqaan, waayo, badbaadintu waxay
ka timaadaa Yuhuudda. **23** Laakiin saacaddii baa imanaysa,
waana joogtaa imminkada, markii caabudayaasha runta ihi
ay Aabbaha ku caabudi doonaan ruuxa iyo runta, waayo,
Aabbuhu wuxuu doonayaa caabudayaashaas oo kale. **24**
Ilaah waa Ruux, kuwa caabudaa isagana waa inay ku
caabudaan ruuxa iyo runta. **25** Naagtii waxay ku tidhi, Waa
ogahay Masiixu inuu imanayo (kan Kiristoos la yidhaahdo);
oo markuu yimaado, wax walba ayuu noo sheegi doonaa.
**26** Markaasaa Ciise wuxuu ku yidhi, Anigoo kula hadlaya
ayaa ah isaga. **27** Isla markii waxaa timid xertiisii, wayna
la yaabeen markay arkeen inuu naag la hadlayo. Weliba
ninna ma odhan, Maxaad doonaysaa? amase, Maxaad
ula hadlaysaa iyada? **28** Sidaa aawadeed naagtii ayaa
ashuunkeedii ka tagtay, oo magaaladay u baxday, oo waxay
ku tidhi dadkii, **29** Kaalaya oo arka ninkii ii sheegay wax
walba oo aan sameeyey. Miyaanu kani ahayn Masiixa? **30**
Markaasay magaaladii ka soo baxeen, wayna u imanayeen
isagii. **31** Kolkaasay xertiisii baryeen iyagoo leh, Macallimow,
wax cun. **32** Laakiin wuxuu iyagii ku yidhi, Anigu waxaan
haystaa cunto aan cuno oo aydnaan ogayn. **33** Haddaba
xertiisii waxay isku yidhaahdeen, Ma loo keenay wuxuu cuno?
**34** Ciise wuxuu ku yidhi, Cuntadaydu waa inaan sameeyo
doonistii kii i soo diray oo aan shuqulkiisa dhammeeyo. **35**
Miyaydnaan odhanin, Waxaa weli hadhay afar bilood oo
markaas ayaa beerta la gooynayaa? Bal eega, waxaan
idin leeyahay, Indhihiinna kor u qaada oo daya beeraha
inay u cad yihiin beergooyska. **36** Kii gooyaa mushahaaruu
helaa, wuxuuna midho u ururiyaa nolosha weligeed ah,
inay kii beera iyo kii gooyaaba isla farxaan. **(aiōnios g166)** **37**
Hadalku waa ku run kan, Mid baa beera, mid kalena waa
gooyaa. **38** Waxaan idiin diray inaad gooysaan wixii aydnaan
ku hawshoon. Kuwa kale baa hawshooday, hawshoodiina
waad gasheen. **39** Waxaa magaaladaas ka rumaystay
isaga dad badan oo reer Samaariya ah, hadalkii naagta
aawadiis, markay marag furtay oo tidhi, Wuxuu ii sheegay
wax walba oo aan sameeyey. **40** Sidaa darteed markii
dadka reer Samaariya ah u yimaadeen isaga, way baryeen
inuu la joogo, wuxuuna halkaas joogay laba maalmood.
**41** Markaasaa kuwo kale oo badani rumaysteen hadalkiisii
aawadiis, **42** oo waxay naagtii ku yidhaahdeen, Imminka
waxaannu u rumaysanaynaa ma aha hadalkaaga aawadiis,
maxaa yeelay, qudhayadu waannu maqalnay, waannuna
naqaan kanu inuu runtii yahay Badbaadiyaha dunida. **43**
Labadaas maalmood dabadeed meeshaas ayuu ka tegey
oo Galili aaday. **44** Oo Ciise ayaa ka marag kacay inaan
nebi waddankiis murwad ku lahayn. **45** Haddaba markuu
Galili yimid, dadkii Galili way soo dhoweeyeen, iyagoo arkay
wuxuu ku sameeyey Yeruusaalem oo dhan wakhtigii iidda,
waayo, iyaguna iiddii way tageen. **46** Haddaba mar kale ayuu
yimid Kaana tii Galili oo ahayd meeshuu biyihii khamriga
kaga dhigay. Meeshaasna waxaa joogay sirkaal wiilkiisii
ku bukay Kafarna'um. **47** Isagu markuu maqlay inuu Ciise
Yahuudiya ka yimid oo Galili gaadhay, ayuu u tegey oo
ka baryay inuu u yimaado oo wiilkiisa bogsiiyo, waayo,
dhimashuu u dhowaa. **48** Haddaba Ciise wuxuu ku yidhi,
Haddaanad calaamooyin iyo yaabab arkin, marnaba ma
rumaysan doontaan. **49** Sirkaalkii wuxuu ku yidhi, Sayidow,
kaalay intaan wiilkaygu dhiman. **50** Ciise wuxuu ku yidhi,
Soco, wiilkaagii waa nool yahay. Markaasaa ninkii rumaystay
hadalkii Ciise ku yidhi, wuuna socday. **51** Intuu socday ayaa
addoommadiisii ka hor yimaadeen, iyagoo leh, Wiilkaagii
waa nool yahay. **52** Markaasuu wuxuu iyagii weyddiiyey
saacadduu ladnaaday. Waxay ku yidhaahdeen, Shalayto
saacaddii toddobaad ayaa qandhadii daysay. **53** Markaasaa
aabbuhu gartay inay saacaddaas ahayd saacaddii Ciise ku
yidhi, Wiilkaagii waa nool yahay. Markaasaa isagii qudhiisu
rumaystay iyo kuwii gurigiisii joogay oo dhan. **54** Haddaba
tanu waa calaamadii labaad oo Ciise sameeyey markuu
Yahuudiya ka tegey oo Galili yimid.

**5** Waxaas dabadeed waxaa jirtay iiddii Yuhuudda, oo Ciise
ayaa Yeruusaalem u kacay. **2** Waxaa Yeruusaalem jirtay,
Albaabka Idaha agtiisa, war biyo ah oo af Cibraani lagu
yidhaahda Beytesda oo leh shan balbaladood. **3** Meelahaas
waxaa jiifay dad badan oo buka oo indha la' oo laxaad la' oo
curyaan ah. Waxay sugayeen biyuhu inay dhaqaaqaan. **4**
Maxaa yeelay, malaa'igta Rabbiga ayaa marmar warta ku
soo degi jirtay oo biyaha qasi jirtay; oo kii ugu hor galay
biyihii markii la qasay dabadeed wuu ka bogsaday cudur
kastuu qabay. **5** Oo waxaa meeshaas joogay nin siddeed
iyo soddon sannadood bukay. **6** Markii Ciise arkay isagoo
jiifa, oo gartay inuu wakhti dheer bukay, wuxuu ku yidhi,
Ma doonaysaa inaad bogsato? **7** Ninkii bukay wuxuu u
jawaabay, oo ku yidhi, Sayidow, nin ma lihi inuu warta igu
rido markii biyaha la qaso, laakiin markaan imaado, mid kale
ayaa iga hor gala. **8** Markaasaa Ciise wuxuu ku yidhi, Kac oo

sariirtaada qaado oo soco. 9 Markiiba ninkii waa bogsaday,
wuuna qaatay sariirtiisii oo socday. Maalintaas waxay ahayd
sabtidii. 10 Sidaas daraaddeed Yuhuuddu waxay kii la
bogsiiyey ku yidhaahdeen, Waa sabti, oo xalaal kuuma aha
inaad sariirtaada qaadatid. 11 Laakiin wuu u jawaabay, oo ku
yidhi, Kii i bogsiiyey ayaa igu yidhi, Sariirtaada qaado oo
soco. 12 Oo waxay weyddiiyeen, oo ku yidhaahdeen, Yuu
yahay ninkii kugu yidhi, Sariirtaada qaado oo soco? 13 Kii la
bogsiiyeyse ma uu oqoonin kuu ahaa, waayo, Ciise waa
tegey, maxaa yeelay, dad badan ayaa meeshaas joogay. 14
Waxaas dabadeed Ciise wuxuu isaga ka helay macbudka oo
ku yidhi, Bal eeg, waad bogsatay, mar dambe ha dembaabin
inaan wax ka sii xumi kugu dhicin. 15 Markaasaa ninkii tegey,
wuuna u sheegay Yuhuuddii inuu ninkii bogsiiyey Ciise ahaa.
16 Sidaa aawadeed Yuhuuddu Ciise way silciyeen, maxaa
yeelay, wuxuu waxyaalahaas sameeyey sabtidii. 17 Laakiin
Ciise wuxuu ugu jawaabay, Aabbahay tan iyo imminka ayuu
shaqeeyaa, aniguna waa shaqeeyaa. 18 Sidaa aawadeed
ayaa Yuhuuddu aad u sii dooneen inay dilaan, sababtu ma
ahayn sabtidii uu jebiyey keliya, laakiin waxay ahayd inuu
Ilaah ugu yeedhay Aabbihiis, iyo inuu isagu Ilaah iskala mid
dhigay. 19 Haddaba Ciise ayaa u jawaabay oo ku yidhi,
Runtii, runtii, waxaan idinku leeyahay, Wiilku keli ahaantiis
waxba ma samayn karo, wuxuu arko Aabbahoo samaynaya
mooyaane. Wax kastoo isagu sameeyo ayaa Wiilkuna sidiisa
u sameeyaa. 20 Waayo, Aabbuhu Wiilkuu jecel yahay, oo
wuxuu tusaa wuxuu isagu sameeyo oo dhan, oo wuxuuna
tusi doonaa shuqullo kuwan ka waaweyn inaad la yaabtaan.
21 Sida Aabbuhu kuwa dhintay u kiciyo oo u nooleeyo ayuu
Wiilkuna sidaas oo kale u nooleeyaa kuwuu doonayo. 22
Aabbuhu ninna ma xukumo, laakiin xukunka oo dhan wuxuu
siiyey Wiilka, 23 in dadka oo dhammu Wiilka maamuuso
siday Aabbaha u maamuusaan. Kii aan Wiilka maamuusi,
ma maamuuso Aabbaha soo diray. 24 Runtii, runtii, waxaan
idinku leeyahay, Kii ereygayga maqla oo rumaysta kii i soo
diray, wuxuu leeyahay nolosha weligeed ah, xukunna geli
maayo, laakiin dhimashadii ayuu ka soo gudbay oo nolosha
u soo gudbay. **(aiōnios g166)** 25 Runtii, runtii, waxaan idinku
leeyahay, Saacaddu waa imanaysaa, waana joogtaa, markii
kuwii dhintay codkii Wiilka Ilaah ay maqli doonaan, oo kuwa
maqlaana way noolaan doonaan. 26 Sida Aabbuhu nolol
isugu leeyahay, sidaasuu Wiilka u siiyey inuu nolol isugu
lahaado. 27 Wuxuuna siiyey amar uu wax ku xukumo, maxaa
yeelay, waa Wiilka Aadanaha. 28 Taas ha la yaabina, waayo,
saacaddu waa imanaysaa markii kuwa xabaalaha ku jiraa
dhammaantood ay codkiisa maqli doonaan, 29 wayna ka soo
bixi doonaan, kuwa wanaagga falay ilaa sarakicidda nolosha,
kuwa sharka falayna ilaa sarakicidda xukunka. 30 Waxba keli
ahaantayda ma samayn karo. Sidaan wax u maqlo ayaan u
xukumaa, xukunkayguna waa xaq, waayo, doonistayda ma
doono, waxaanse doonaa doonista kii i soo diray. 31 Haddaan
isu marag furo, maraggaygu run ma aha. 32 Laakiin waxaa
jira mid kale oo ii marag fura, waanan ogahay maragguu ii
furaa inuu run yahay. 33 Waxaad cid u soo dirteen Yooxanaa,
wuuna u marag furay runta. 34 Aniguse xagga dadka marag
kama aan qaato, laakiin waxyaalahan waxaan u idhaahdaa
inaad badbaaddaan. 35 Isagu wuxuu ahaa laambad baxaysa
oo ifaysa, idinkuna waxaad doonayseen inaad saacad ku
faraxdaan nuurkiisa. 36 Laakiin maraggaan leeyahay waa ka
weyn yahay kii Yooxanaa, waayo, shuqullada Aabbuhu i
siiyey inaan dhammeeyo waa kuwaan hadda samaynayo,
wayna ii marag furayaan in Aabbuhu i soo diray. 37 Aabbihii
i soo dirayna waa ii marag furay. Idinkuna codkiisa ma
maqlin goornaba, mana aydnaan arkin muuqiisa. 38 Mana
haysataan ereygiisa oo idinku sii jira, waayo, kii uu soo diray
waad rumaysan weydeen. 39 Qorniinka ayaad baadhaan,
waayo, waxaad u malaynaysaan inaad nolosha weligeed ah
ka helaysaan, waana iyaga kuwa ii marag furayaa. **(aiōnios
g166)** 40 Idinkuna dooni maysaan inaad ii timaadaan inaad
nolol lahaataan. 41 Anigu dadka ammaan kama qaato. 42
Laakiin waan idin aqaan inaan jacaylka Ilaah idinku jirin.
43 Waxaan ku imid Aabbahay magiciis, idinkuna waad i
aqbali weydeen. Haddiise mid kale magiciisa ku yimaado,
kaasaad aqbalaysaan. 44 Sidee baad u rumaysan kartaan,
idinkoo dhexdiinna ammaan iska aqbalaya, oo aydnaan
doonayn ammaanta ka timaada Ilaaha keligiis ah? 45 Ha u
malaynina inaan Aabbaha idinku ashtakaynayo: kan idin
ashtakaynayaa waa Muuse, kii aad isku hallayseen. 46
Waayo, haddaad Muuse rumaysateen, anigana waad i
rumaysan lahaydeen, waayo, wax buu iga qoray. 47 Laakiin
haddaydnan rumaysan wuxuu qoray, sidee baad u rumaysan
doontaan ereyadayda?

**6** Waxaas dabadeed Ciise wuxuu u kacay dhinaca kale oo
badda Galili oo ahayd baddii Tiberiyas. 2 Dad badanna
way raaceen, waayo, waxay arkeen calaamooyinkii uu ku
sameeyey kuwii bukay. 3 Kolkaasaa Ciise buurta u baxay,
halkaasna ayuu xertiisii la fadhiistay. 4 Markaasna waxaa
dhowayd Iiddii Kormaridda ee ahayd iiddii Yuhuudda. 5
Haddaba Ciise intuu indhihiisii kor u qaaday, ayuu wuxuu
arkay dad badan oo soo socda, wuxuuna Filibos ku yidhi,
Xaggee baynu kibis ka soo iibinnaa inay kuwanu cunaan? 6
Wuxuu waxaas ugu yidhi inuu jirrabo isaga, waayo, isaga
qudhiisu waa ogaa wuxuu samayn lahaa. 7 Filibos wuxuu

ugu jawaabay, Laba boqol oo dinaar oo kibis ahi kuma filla
in nin walba wax yar qaato. 8 Markaasaa xertiisii midkood
oo Andaros la odhan jiray oo Simoon Butros walaalkiis
ahaa wuxuu ku yidhi, 9 Halkan waxaa jooga wiil qaba
shan kibsood oo shaciir ah iyo laba kalluun, laakiin waxaasi
maxay u tarayaan dad sidan u badan? 10 Markaasaa Ciise
yidhi, Dadka fadhiisiya. Meeshaasina waxay lahayd doog
badan. Haddaba nimankii waa fadhiisteen, tiradooduna
qiyaastii waxay ahayd shan kun. 11 Haddaba Ciise kibistuu
qaaday, oo goortuu mahadnaqay ayuu u qaybiyey kuwii
fadhiyey, sidaas oo kalena kalluunkii intay doonayeen. 12
Markay wada dhergeen, wuxuu xertiisii ku yidhi, Ururiya
jajabkii hadhay, waxba yaanay ka hallaabin. 13 Sidaa
aawadeed ayay ururiyeen, oo laba iyo toban dambiilood
ayay ka buuxiyeen jajabkii ka hadhay kuwii shantii kibsood
oo shaciirka ahayd cunay. 14 Haddaba dadkii markay arkeen
calaamadii uu sameeyey, waxay yidhaahdeen, Runtii, kanu
waa nebigii dunida iman lahaa. 15 Ciise wuxuu gartay
inay imanayaan inay qabtaan oo boqor ka dhigaan, sidaas
daraaddeed ayuu mar kale keligiis buurta u baxay. 16 Markii
makhribkii la gaadhay ayaa xertiisii badda u baxday. 17
Waxayna fuuleen doonni, oo badday ka tallaabayeen ilaa
Kafarna'um. Oo markiiba gudcur bay ahayd, Ciisena weli
uma uu iman. 18 Badduna way isku kacday, dabayl weyn oo
dhacday aawadeed. 19 Haddaba markay seeb ku wadeen
qiyaas shan iyo labaatan ama soddon istaadiyon, waxay
arkeen Ciise oo badda ku dul socda oo doonnida u soo
dhowaanaya, wayna baqeen. 20 Laakiin wuxuu ku yidhi, Waa
aniga ee ha baqina. 21 Sidaa aawadeed waxay doonayeen
inay doonnida ku qaadaan, oo markiiba doonnidu waxay
joogtay dhulkay u socdeen. 22 Maalintii labaad dadkii badnaa
oo badda dhankeeda kale taagnaa, waxay arkeen inaan
doonni kale joogin mid maahee, oo aan Ciisena taas la fuulin
xertiisii, laakiin in xertiisii keligood baxeen. 23 Laakiin waxaa
Tiberiyas ka yimid doonniyo, wayna u soo dhowaadeen
meeshii kibistii lagu cunay markuu Rabbigu mahadnaqay
dabadeed. 24 Markii dadkii badnaa arkeen inaan Ciise
halkaas joogin iyo xertiisiiba, waxay fuuleen doonniyihii,
wayna yimaadeen Kafarna'um, iyagoo Ciise doondoonaya.
25 Oo markay isaga ka heleen badda dhinaceeda kale,
waxay ku yidhaahdeen, Macallimow, goormaad halkan timid?
26 Ciise ayaa u jawaabay oo ku yidhi, Runtii, runtii, waxaan
idinku leeyahay, Iima doondoontaan calaamooyinkii aad
aragteen aawadood ee waa kibistii aad cunteen oo aad
ka dheregteen aawadeed. 27 Ha u shaqaynina cuntada
hallaabaysa, laakiin u shaqeeya cuntada sii jiraysa ilaa
nolosha weligeed ah ee Wiilka Aadanahu idin siin doono,
waayo, isaga Aabbaha Ilaaha ah ayaa caddeeyey. **(aiōnios
g166)** 28 Sidaas aawadeed waxay ku yidhaahdeen, Maxaannu
yeelnaa si aannu shuqullada Ilaah u samayno? 29 Ciise
ayaa u jawaabay oo ku yidhi, Kanu waa shuqulkii Ilaah inaad
rumaysataan kii uu soo diray. 30 Sidaa darteed waxay ku
yidhaahdeen, Haddaba calaamadee baad samaynaysaa
inaannu aragno oo ku rumaysanno? Maxaad, samaynaysaa?
31 Awowayaasheen waxay cidlada ku cuneen maannada
sidii loo qoray, Wuxuu samada ka siiyey kibis ay cunaan.
32 Haddaba Ciise wuxuu ku yidhi, Runtii, runtii, waxaan
idinku leeyahay, Muuse samada idinkama siin kibistii, laakiin
Aabbahay baa samada idinka siiya kibista runta ah. 33
Waayo, kibista Ilaah waa kan samada ka soo degay oo
dunida nolosha siiya. 34 Haddaba waxay ku yidhaahdeen,
Sayidow, kibistan mar walba na sii. 35 Markaasaa Ciise
wuxuu ku yidhi, Anigu waxaan ahay kibista nolosha. Kii
ii yimaadaa ma gaajoon doono, kii i rumaystaana ma
harraadi doono weligiis. 36 Laakiin waxaan idiin sheegay
inaad i aragteen, mase rumaysataan. 37 Dhammaan wuxuu
Aabbuhu i siiyo way ii iman doonaan, oo kii ii yimaadana
ma eryi doono. 38 Waayo, waxaan samada uga soo degay
ma aha inaan doonistayda yeelo, laakiinse inaan yeelo
doonista kii i soo diray. 39 Tanu waa doonistii kii i soo diray
in kuwii uu dhammaan i siiyey aanan midna ka lumin, laakiin
inaan maalinta u dambaysa soo sara kiciyo. 40 Waayo,
tanu waa doonistii Aabbahay in mid kasta oo Wiilka arka oo
rumaysta uu nolosha weligeed ah lahaado, aniguna maalinta
u dambaysa waan soo sara kicin doonaa. **(aiōnios g166)** 41
Sidaas aawadeed Yuhuuddu way gunuuneceen, maxaa
yeelay, wuxuu yidhi, Anigu waxaan ahay kibista samada
ka soo degtay. 42 Waxayna yidhaahdeen, Kanu miyaanu
ahayn Ciise, ina Yuusuf, kaannu aabbihiis iyo hooyadiis
naqaan? Hadda sidee buu u leeyahay, Samada baan ka
soo degay? 43 Markaasaa Ciise u jawaabay oo ku yidhi,
Ha ka gunuunecina dhexdiinna. 44 Ninna iima iman karo
hadduusan Aabbihii i soo diray soo jiidin, aniguna maalinta u
dambaysa waan soo sara kicin doonaa. 45 Waxaa ku qoran
kitaabbadii nebiyada, Kulligood Ilaah baa wax bari doona.
Mid kasta oo Aabbaha wax ka maqlay oo ka bartay waa ii
yimaadaa. 46 Ma aha in nin arkay Aabbaha, kii Ilaah ka
yimid mooyaane. Isagu waa arkay Aabbaha. 47 Runtii, runtii,
waxaan idinku leeyahay, Kii i rumaystaa, wuxuu leeyahay
nolosha weligeed ah. **(aiōnios g166)** 48 Anigu waxaan ahay
kibista nolosha. 49 Awowayaashiin waxay cidlada ku cuneen
maannada, oo ay dhinteen. 50 Tanu waa kibistii samada
ka soo degtay, in qof kasta cuno oo uusan dhiman. 51
Anigu waxaan ahay kibista nool ee samada ka soo degtay.

Haddii qof uun kibistan cuno, weligiis wuu noolaan doonaa. Oo kibistaan siin doonaa waa jidhkayga, nolosha dunida aawadeed. **(aiōn g165)** **52** Sidaa aawadeed Yuhuuddu way isla murmeen iyagoo leh, Kanu sidee buu jidhkiisa inoo siin karaa inaannu cunno? **53** Ciise haddaba wuxuu ku yidhi, Runtii, runtii, waxaan idinku leeyahay, Haddaydnan jidhkii Wiilka Aadanaha cunin oo dhiiggiisa cabbin nolosha kuma lihidin gudihiinna. **54** Oo kii jidhkayga cuna oo dhiiggayga cabba wuxuu leeyahay nolosha weligeed ah, oo maalinta u dambaysa waan soo sara kicin doonaa. **(aiōnios g166)** **55** Waayo, runtii jidhkaygu waa cunto, dhiiggayguna runtii waa wax la cabbo. **56** Kii jidhkayga cuna oo dhiiggayga cabba wuu igu jiraa, anna waan ku jiraa isaga. **57** Sida Aabbaha nool ii soo diray, aniguna Aabbahaan u noolahay daraaddiis, sidaasaa kii i cunaa isaguna u nolaan doonaa daraadday. **58** Tanu waa kibista samada ka soo degtay, ma aha sida tii awowayaashiin cuneen oo ay dhinteen. Kii kibistan cunaa, weligiis wuu noolaan doonaa. **(aiōn g165)** **59** Waxyaalahaas ayuu sunagogga kaga dhex hadlay intuu Kafarna'um wax ku barayay. **60** Sidaa aawadeed xertiisii badidood markay maqleen, waxay yidhaahdeen, Hadalkaasu waa adag yahay. Yaa maqli kara? **61** Laakiin Ciise qudhiisu wuu ogaa in xertiisu taas ka gunuunacday, wuxuuna ku yidhi, Taas ma ka xun tihiin? **62** Haddaba maxay noqon haddaad aragtaan Wiilka Aadanaha oo kor ugu baxaya meeshuu markii hore joogi jiray? **63** Waa ruuxa kan wax nooleeyaa, jidhkuse waxba ma taro. Erayadii aan idinkula hadlayna waxay yihiin ruux iyo nololba. **64** Laakiin waxaa dhexdiina jira qaar idinka mid ah oo aan rumaysan. Waayo, tan iyo bilowgii Ciise waa garanayay kuway ahaayeen kuwa aan rumaysan iyo kuu ahaa kii gacangelin lahaa. **65** Markaasuu yidhi, Taas aawadeed waxaan idinku idhi, Qofna iima iman karo haddaan Aabbuhu awood siin. **66** Taas dabadeed xertiisii intii badnayd dib bay uga noqdeen, oo mar dambe lama ay socon. **67** Haddaba Ciise wuxuu laba-iyo-tobankii ku yidhi, Idinkuna ma doonaysaan inaad tagtaan? **68** Markaasaa Simoon Butros wuxuu ugu jawaabay, Sayidow, yaannu u tagnaa? Adigaa haya erayadii nolosha weligeed ahe. **(aiōnios g166)** **69** Annaguna waa rumaysannay, waana og nahay inaad tahay Kan Quduuska ah ee Ilaah. **70** Ciise wuxuu ugu jawaabay, Miyaanan idin dooran idinkoo laba iyo toban ah? Mid idinka mid ahna waa cifriid. **71** Wuxuu ka hadlay Yuudas ina Simoon Iskariyod, waayo, isaguu ahaa kan gacangelin lahaa, isagoo laba-iyo-tobankii ka mid ahaa.

**7** Waxyaalahaas dabadeed Ciise ayaa Galili ku dhex wareegay, waayo, ma u doonaynin inuu Yahuudiya ku wareego, maxaa yeelay, Yuhuuddu waxay doonayeen inay dilaan. **2** Iiddii Yuhuudda oo tii waababka ahayd way dhowayd. **3** Walaalihiis haddaba waxay ku yidhaahdeen, Halkan ka bax oo Yahuudiya tag in xertaadiina aragto shuqullada aad samaynaysid. **4** Ma jiro nin si qarsoon wax u sameeyaa markuu doonayo in bayaan loo ogaado. Haddaad waxyaalahan samayso, dunida isu muuji. **5** Xataa walaalihiis ma ay rumaysan isaga. **6** Sidaa aawadeed Ciise wuxuu ku yidhi iyaga, Wakhtigaygu weli ma iman, laakiin wakhtigiinnu goor walba wuu joogaa. **7** Dunidu idinma nebcaan karto, anigase way i neceb tahay, waayo, waxaan ka marag furaa in shuqulladeedu ay shar yihiin. **8** Idinku iidda u kaca, anigu iiddan weli u kici maayo, waayo, wakhtigaygu weli ma dhammaan. **9** Markuu waxyaalahaas iyagii ku yidhi, weli wuxuu sii joogay Galili. **10** Markii walaalihiis iiddii u kaceen, ayuu isaguna markaas xaggeeda u kacay, bayaan kuma tegin, laakiin sidii mid isqarinaya buu u tegey. **11** Yuhuuddu haddaba iidday ka dooneen, oo waxay yidhaahdeen, Xaggee buu joogaa? **12** Dadkii badnaa aad bay uga gunuuneceen isaga, qaarkood waxay yidhaahdeen, Waa nin wanaagsan; qaar kalena waxay yidhaahdeen, Sidaas ma aha, laakiin dadkii badnaa ayuu khiyaaneeyaa. **13** Haddaba ninna bayaan isaga ugama hadlin cabsiday ka cabsanayeen Yuhuudda aawadeed. **14** Laakiin markay ahayd iidda dhexdeeda Ciise wuxuu u kacay macbudka, wax ayuuna ku baray. **15** Sidaa aawadeed Yuhuuddii ayaa la yaabtay iyagoo leh, Sidee baa kanu qorniinka u yaqaan isagoo aan weligiis baran? **16** Ciise ayaa haddaba u jawaabay oo ku yidhi, Waxbariddaydu tayda ma aha, laakiin waxaa leh kan i soo diray. **17** Haddii nin doonayo inuu doonistii Ilaah sameeyo, wuu garan doonaa waxbaridda, inay tahay tii Ilaah amase aan qudhaydu iska hadlayo. **18** Kan qudhiisu iska hadlaa, ammaantiisuu doonaa, laakiin kan doona ammaanta kan soo diray, kaasaa run ah, oo xaqdarro kuma jirto. **19** Miyaan Muuse sharciga idin siin? Midkiinnana sharciga ma yeelo. Maxaad u doonaysaan inaad i dishaan? **20** Dadkii badnaa waxay ugu jawaabeen, Jinni baad qabtaa. Yaa doonaya inuu ku dilo? **21** Ciise ayaa u jawaabay oo ku yidhi, Shuqul keliya ayaan sameeyey, kulligiinna waad la yaabteen. **22** Sidaa aawadeed Muuse wuxuu idin siiyey gudniinta (kamana iman Muuse, waxayse ka timid awowayaashii); idinku sabtida ayaad nin guddaan. **23** Haddii sabtida nin la gudo, si aan sharciga Muuse u jabin, ma waxaad iigu cadhoonaysaan nin aan dhammaantiis sabtidii bogsiiyey? **24** Aragtida waxba ha ku xukumina, laakiin ku xukuma xukunka xaqa ah. **25** Sidaa aawadeed qaar ka mid ah kuwa Yeruusaalem waxay yidhaahdeen, Kanu miyaanu ahayn kay doonayaan inay

dilaan? 26 Bal fiiriya, bayaan buu u hadlaa, waxbase kuma
yidhaahdaan. Taliyayaashu runtii ma og yihiin inuu kanu
yahay Masiixa? 27 Laakiin kani meeshuu ka yimid waannu
og nahay, markuuse Masiixu yimaado, ninna garan maayo
meeshuu ka imanayo. 28 Ciise haddaba macbudkuu ka
dhex qayliyey isagoo wax baraya oo leh, Waad i taqaanniin,
waana og tihiin meeshaan ka imid; anigu qudhayda kuma
aan iman, laakiin kii i soo diray waa run, kan aydnaan
garanaynin. 29 Anigu waa aqaan, waayo, isagaan ka imid,
wuuna i soo diray. 30 Sidaa aawadeed waxay dooneen
inay qabtaan, laakiin ninna faro ma uu saarin, waayo,
saacaddiisii weli ma iman. 31 Laakiin qaar badan oo dadkii
ahi way rumaysteen, waxayna yidhaahdeen, Masiixu markuu
yimaado miyuu samayn doonaa calaamooyin ka badan
kuwii kanu sameeyey? 32 Farrisiintu way maqleen dadkii
badnaa oo ka gunuunacayay waxaas ku saabsanaa isaga,
wadaaddadii sarena iyo Farrisiintii waxay u direen saraakiil
inay soo qabtaan isaga. 33 Ciise haddaba wuxuu ku yidhi,
Weli in yar baan idinla joogayaa, markaasaan u tegayaa
kii i soo diray. 34 Waad i doondooni doontaan, imana heli
doontaan, meeshaan joogona iman kari maysaan. 35 Sidaa
aawadeed Yuhuuddu waxay isku yidhaahdeen, Kanu xaggee
buu tegi doonaa oo aynaan ka heli doonin? Ma wuxuu u tegi
doonaa kuwa ku kala firidhsan dadka Gariigta ah, oo wax
bari doonaa dadka Gariigta ah? 36 Waa maxay hadalkan uu
yidhi? Waad i doondooni doontaan, imana heli doontaan,
meeshaan joogona ma iman kari doontaan. 37 Maalintii u
dambaysay, oo ahayd maalintii weynayd ee iidda, Ciise ayaa
istaagay oo qayliyey isagoo leh, Haddii qof uun harraado,
ha ii yimaado, hana cabbo. 38 Kii i rumaysta, calooshiisa
waxaa ka duuli doona webiyo biyaha nool ah, sida Qorniinku
u yidhi. 39 Waxaas ayuu kaga hadlay Ruuxa oo ay kuwii
isaga rumaystay heli doonaan, waayo, Ruuxa weli lama
bixin, maxaa yeelay, Ciise weli ma ammaanmin. 40 Sidaa
aawadeed dadkii badnaa qaarkood, goortay hadalladaas
maqleen, waxay yidhaahdeen, Runtii kanu waa nebigii. 41
Qaar kalena waxay yidhaahdeen, Kanu waa Masiixii. Qaarse
waxay yidhaahdeen, Laakiin Masiixii ma wuxuu ka imanayaa
Galili? 42 Qorniinku miyaanu odhan, Masiixu wuxuu ka iman
doonaa farcanka Daa'uud iyo tuuladii Beytlaxam oo Daa'uud
joogay? 43 Sidaa daraaddeed dadkii badnaa waa kala
qaybsamay aawadiis. 44 Qaarkood baa doonay inay qabtaan,
laakiinse ninna faro ma uu saarin. 45 Saraakiishii haddaba
waxay u yimaadeen wadaaddadii sare iyo Farrisiintii, iyaguna
waxay ku yidhaahdeen, Maxaad u keeni weydeen? 46
Saraakiishii waxay ugu jawaabeen, Ninna weligiis uma
hadlin sida ninkaasi u hadlay. 47 Farrisiintii haddaba waxay
iyaga ugu jawaabeen, Idinkana ma laydin khiyaaneeyey?
48 Miyaa taliyayaasha midkood ama Farrisiinta rumaystay
isaga? 49 Laakiin dadkan badan oo aan sharciga garanaynin
waa inkaaran yihiin. 50 Nikodemos (kii markii hore Ciise u
yimid, isagoo ah midkood) wuxuu iyaga ku yidhi, 51 Miyaa
sharcigeennu xukumaa nin, iyadoo aan marka hore laga
maqlin isaga oo aan la garanaynin wuxuu sameeyo? 52
Kolkaasay u jawaabeen oo waxay ku yidhaahdeen, Adiguna
ma reer Galili baad tahay? Doondoon, oo arag inaan nebi
ka kacayn Galili. 53 Markaasaa nin kastaa wuxuu u baxay
gurigiisii.

8 Ciisese wuxuu u baxay Buur Saytuun. 2 Aroortii hore
ayuu haddana macbudka yimid, dadkii oo dhammuna
way u yimaadeen, oo intuu fadhiistay, ayuu wax baray.
3 Culimmadii iyo Farrisiintii waxay u keeneen naag sino
lagu qabtay. Markaasay dhexda joojiyeen, 4 oo waxay
isagii ku yidhaahdeen, Macallimow, naagtan waxaa lagu
qabtay sino. 5 Hadda Muuse wuxuu sharciga nagu amray
in la dhagxiyo tan oo kale, adiguse maxaad ka leedahay
iyada? 6 Waxay waxaas u yidhaahdeen, iyagoo jirrabaya, si
ay u helaan wax ay ku ashtakeeyaan. Laakiin Ciise waa
foororsaday, oo farta ayuu dhulka wax ku qoray. 7 Laakiin
goortay sii wadeen inay weyddiiyaan, wuu istaagay, oo
wuxuu ku yidhi, Kii idinka mid ah oo aan dembi lahayn, isagu
horta dhagax ha ku tuuro. 8 Mar kale ayuu foororsaday,
oo haddana dhulka wax ku qoray. 9 Iyagu markay waxaas
maqleen, ayay iska daba baxeen midba mid, waayeelladii
ka bilaabato ilaa kii u dambeeyey. Ciisena keligiis ayuu
hadhay iyo naagtii dhexda joogtay. 10 Ciise ayaa istaagay
oo ku yidhi iyadii, Naag yahay, xaggee bay joogaan? Ninna
miyaanu ku xukumin? 11 Waxay ku tidhi, Ninna, Sayidow.
Ciisena wuxuu ku yidhi, Anna ku xukumi maayo. Soco, oo
hadda ka dib ha dembaabin. 12 Haddaba Ciise ayaa mar
kale la hadlay iyaga, oo wuxuu ku yidhi, Anigu waxaan
ahay nuurka dunida. Kii i soo raacaa, gudcurka kuma socon
doono, wuxuuse lahaan doonaa nuurka nolosha. 13 Sidaa
aawadeed Farrisiintu waxay ku yidhaahdeen, Marag baad
isu furaysaa, maraggaagguna run ma aha. 14 Ciise baa u
jawaabay oo wuxuu ku yidhi, In kastoo aan marag isu furo,
maraggaygu waa run, waayo, waxaan garanayaa meeshaan
ka imid iyo meeshaan tegayo, idinkuse garan maysaan
meeshaan ka imid ama meeshaan tegayo. 15 Idinku waxaad
wax ka xukuntaan xagga jidhka, aniguse ninna ma xukumo.
16 Haddaan xukumo, xukunkaygu waa run, waayo, anigu
keligay ma ihi, laakiin waa aniga iyo Aabbahaygii i soo diray.
17 Sharcigiinna waxaa ku qoran, Laba nin maraggoodu waa

run. 18 Anigu waxaan ahay kii isu marag fura, oo Aabbahaygii
i soo dirayna ayaa ii marag fura. 19 Sidaas aawadeed
waxay ku yidhaahdeen, Aabbahaa xaggee buu joogaa?
Ciise ayaa ugu jawaabay, I garan maysaan, Aabbahayna
garan maysaan. Haddaad i garanaysaan, Aabbahayna waad
garan lahaydeen. 20 Hadalladaas ayuu kaga hadlay meeshii
khasnaddu tiil intuu macbudka wax ku barayay. Oo ninna ma
uu qaban isaga, waayo, saacaddiisii weli ma iman. 21 Sidaas
aawadeed wuxuu haddana ku yidhi iyaga, Waan tegayaa,
waadna i doondooni doontaan, waadna ku dhiman doontaan
dembigiinna. Meeshaan tegayo iman kari maysaan. 22
Sidaas daraaddeed Yuhuuddu waxay yidhaahdeen, Miyuu
isdilayaa? Waayo, isagaa yidhi, Meeshaan tegayo iman kari
maysaan. 23 Wuxuu ku yidhi iyaga, Idinku waxaad tihiin
kuwa hoosta, aniguse waxaan ka mid ahay kuwa sare. Idinku
waxaad tihiin kuwa dunidan, aniguse mid kama ihi kuwa
dunidan. 24 Haddaba waxaan idinku idhi, Dembiyadiinna
waad ku dhiman doontaan, waayo, haddaydnan rumaysan
inaan isagii ahay, dembiyadiinna ayaad ku dhiman doontaan.
25 Haddaba waxay ku yidhaahdeen, Yaad tahay? Ciise wuxuu
ku yidhi, Kii aan tan iyo bilowgii idinkala hadlay. 26 Waxaan
hayaa wax badan oo aan idinkala hadlo oo aan idinku
xukumo, laakiin kii i soo diray waa run, aniguna waxaan
ka maqlay isaga, waxaas ayaan dunida kula hadlayaa. 27
Ma ayna garan inuu iyaga kala hadlay Aabbaha. 28 Sidaas
aawadeed Ciise ayaa ku yidhi, Markaad Wiilka Aadanaha
kor u qaaddaan, markaasaad garan doontaan inaan isagii
ahay iyo inaanan keligay waxba samaynaynin, laakiin sida
Aabbuhu ii baray ayaan waxyaalahaas ugu hadlaa. 29 Oo
kii i soo diray ayaa ila jira, keligay igama uu tegin, waayo,
mar kasta waxaan sameeyaa waxa ka farxiya isaga. 30
Intuu waxyaalahaas ku hadlayay, dad badan ayaa rumaystay
isaga. 31 Sidaas aawadeed Ciise wuxuu ku yidhi Yuhuuddii
isaga rumaysatay, Haddaad ereygayga ku sii socotaan, runtii
waxaad tihiin xertayda. 32 Oo waxaad garan doontaan runta;
runtiina waa idin xorayn doontaa. 33 Waxay ugu jawaabeen,
Farcankii Ibraahim baannu nahay, oo weligayo addoommo
ninna uma ahayn. Maxaad u leedahay, Waa laydin xorayn
doonaa? 34 Ciise ayaa ugu jawaabay, Runtii, runtii, waxaan
idinku leeyahay, Kii kasta oo dembi sameeyaa waa addoonkii
dembiga. 35 Oo addoonkuna guriga kuma sii jiro, wiilkuse
waa ku sii jiraa weligiis. (aiōn g165) 36 Sidaas aawadeed
haddii Wiilku idin xoreeyo, runtii xor baad ahaan doontaan.
37 Waan garanayaa inaad farcankii Ibraahim tihiin, laakiin
waxaad doonaysaan inaad i dishaan, waayo, hadalkaygu
meel idinkuma haysto. 38 Waxaan xaggii Aabbahay ku soo
arkay ayaan ka hadlaa, idinkuna waxaad samaysaan wixii
aydin aabbihiin ka maqasheen. 39 Markaasay u jawaabeen
oo waxay ku yidhaahdeen, Aabbahayo waa Ibraahim. Ciise
ayaa ku yidhi, Haddaad carruurtii Ibraahim tihiin, shuqullada
Ibraahim waad samayn lahaydeen. 40 Laakiin hadda waxaad
doonaysaan inaad i dishaan, anoo ah ninkii idiin sheegay
runtii aan xaggii Ilaah ka maqlay. Waxaas Ibraahim ma uu
samayn jirin. 41 Waxaad samaysaan shuqullada aabbihiin.
Markaasay ku yidhaahdeen, Annagu kuma aannu dhalan
sino. Aabbe keliya ayaannu leennahay oo waa Ilaah. 42 Ciise
wuxuu ku yidhi, Haddii Ilaah aabbihiin yahay, waad i jeclaan
lahaydeen, maxaa yeelay, Ilaah baan ka soo baxay oo ka
imid, aniguna iskama iman, ee isagaa i soo diray. 43 Maxaad
hadalkayga u garan weydeen? Waayo, hadalkayga ma
maqli karaysaane. 44 Idinku waxaad tihiin kuwo aabbahood
Ibliiska yahay, oo waxaad doonaysaan inaad samaysaan
damacyada aabbihiin. Tan iyo bilowgii wuxuu ahaa mid dhiig
qaba, runtana kuma uu joogsan, waayo, runtu kuma jirto
isaga. Markuu been ku hadlo, tiisuu ku hadlaa, waayo, waa
beenaaleh, waana beenta aabbaheed. 45 Laakiin runta
aan ku hadlo aawadeed waad i rumaysan weydeen. 46
Midkiinnee baa dembi igu caddaynaya? Haddaan runta
sheego, maxaad ii rumaysan weydaan? 47 Kii Ilaah kuwiisa
ka mid ah, erayada Ilaah ayuu maqlaa, sidaas daraaddeed
idinku maqli maysaan, waayo, Ilaah kuwiisii ma ihidin. 48
Yuhuuddu waxay ugu jawaabeen, Miyaannan run ku hadlin
markaannu nidhi, Reer Samaariya baad tahay, oo jinni
baad qabtaa? 49 Ciise wuxuu ugu jawaabay, Jinni ma
qabo, laakiin Aabbahay baan murweeyaa, idinkuna waad
i murwad jebisaan. 50 Anigu ammaantayda ma doono,
waxaase jira mid doona oo xukuma. 51 Runtii, runtii, waxaan
idinku leeyahay, Haddii qof uun ereygayga xajiyo, weligiis
dhimasho ma arki doono. (aiōn g165) 52 Yuhuuddu waxay ku
yidhaahdeen isaga, Imminka waxaannu garanaynaa inaad
jinni qabto. Ibraahim waa dhintay iyo nebiyadiiba, adiguna
waxaad leedahay, Haddii qof uun hadalkayga xajiyo, weligiis
dhimasho ma dhadhamin doono. (aiōn g165) 53 Miyaad
ka sii weyn tahay aabbaheen Ibraahim oo dhintay, iyo
nebiyadii dhintay? Yaad iska dhigaysaa? 54 Ciise wuxuu ugu
jawaabay, Haddaan is-ammaano, ammaantaydu waxba ma
aha. Waa Aabbahay kan i ammaanaa, kaad ku sheegtaan
Ilaahiinna. 55 Mana aydnaan garan isaga, laakiinse anigu
waa garanayaa, oo haddaan idhaahdo, Garan maayo isaga,
sidiinna oo kalaan beenaaleh noqonayaa, laakiinse waan
aqaan isaga, ereygiisana waan xajiyaa. 56 Aabbihiin Ibraahim
waa ku reyreeyey inuu maalintayda arko, wuuna arkay
oo ku farxay. 57 Sidaa aawadeed Yuhuuddii waxay ku
yidhaahdeen, Weli konton sannadood ma aadan gaadhin,

oo Ibraahim ma aragtay? 58 Ciise wuxuu ku yidhi, Runtii,
runtii, waxaan idinku leeyahay, Intaan Ibraahim jirin anaa ah.
59 Markaasay dhagaxyo u gurteen inay ku tuuraan, laakiin
Ciise waa dhuuntay, wuuna ka baxay macbudka.

**9** Ciise intuu socday, wuxuu arkay nin indhala'aan
ku dhashay. 2 Xertiisu waxay weyddiiyeen oo ku
yidhaahdeen, Macallimow, yaa dembaabay, ma kan baa mise
waa waalidkiis, inuu indhala'aan ku dhasho? 3 Ciise ayaa
ugu jawaabay, Ninkan iyo waalidkiis midna ma dembaabin,
laakiin waa in shuqullada Ilaah lagu muujiyo isaga. 4 Waa
inaan samayno shuqullada kii i soo diray intay maalin tahay;
habeen baa imanaya mar aan ninna shaqayn karin. 5 Intaan
dunida joogo, waxaan ahay nuurkii dunida. 6 Markuu sidaas
yidhi, ayuu dhulka candhuuf ku tufay, oo candhuuftii dhoobo
ka sameeyey, markaasuu dhoobadii wuxuu mariyey ninkii
indhihiisii, 7 oo ku yidhi, Bax oo ku soo maydho balliga
Siloo'am la yidhaahdo (oo fasirkiisii yahay, Waa la diray).
Wuu tegey haddaba oo soo maydhay, markaasuu yimid
isagoo wax arkaya. 8 Sidaa daraaddeed derisyadii iyo kuwii
hortii arki jiray inuu miskiin yahay, waxay yidhaahdeen, Kanu
miyaanu ahayn kii fadhiyi jiray oo dawarsan jiray? 9 Qaar baa
yidhi, Waa isagii, Qaarna waxay yidhaahdeen, Maya, laakiin
waa u eg yahay. Isagaa yidhi, Isagii baan ahay. 10 Sidaa
daraaddeed waxay ku yidhaahdeen, Haddaba sidee bay
indhahaagu u furmeen? 11 Wuxuu ugu jawaabay, Ninka Ciise
la yidhaahdo ayaa dhoobo sameeyey oo indhahayga mariyey,
oo wuxuu igu yidhi, Siloo'am u kac, oo ku soo maydho, Sidaa
aawadeed ayaan tegey, oo markaan soo maydhay ayaan
arag helay. 12 Kolkaasay waxay ku yidhaahdeen, Xaggee
buu joogaa? Isaguse wuxuu ku yidhi, Ma ogi. 13 Markaasaa
kii markii hore indhaha la'aa waxaa loo geeyey Farrisiintii. 14
Waxayna ahayd sabti maalintii Ciise dhoobada sameeyey
oo indhihiisii furay. 15 Mar kale haddaba Farrisiintii waxay
weyddiiyeen siduu araggiisa ku helay. Markaasuu wuxuu ku
yidhi, Dhoobuu indhahayga mariyey, oo aan maydhay, oo
wax baan arkayaa. 16 Sidaa aawadeed Farrisiinta qaarkood
waxay yidhaahdeen, Ninkan xaggii Ilaah kama iman, waayo,
sabtida ma dhawro. Qaar kalese waxay yidhaahdeen, Sidee
baa nin dembi leh calaamooyinkan oo kale u samayn
karaa? Markaasay kala qaybsameen dhexdoodii. 17 Waxay
haddaba ninkii indhaha la'aa ku yidhaahdeen, Maxaad ka
leedahay isaga, waayo, waa kan indhahaaga furaye? Wuxuu
ku yidhi, Waa nebi. 18 Sidaa aawadeed Yuhuuddu kama
rumaysanin inuu indha la'aa, oo uu araggiisa helay, ilaa ay u
yeedheen waalidkii kii araggiisa helay, 19 oo weyddiiyeen,
iyagoo leh, Kanu ma wiilkiinnii baa aad leedihiin, Wuxuu
ku dhashay indhala'aan? Sidee buu hadda wax ku arkaa?
20 Waalidkiis waxay haddaba ugu jawaabeen, Waannu
garanaynaa kani inuu wiilkayagii yahay oo uu indhala'aan
ku dhashay, 21 laakiin siduu hadda wax ku arko garan
mayno, kii indhihiisii furayna garan mayno. Isaga weyddiiya.
Waa nin weyn. Waa isu hadli doonaaye. 22 Waxyaalahaas
waxay waalidkiis u yidhaahdeen, waayo, Yuhuudday ka
baqeen. Maxaa yeelay, Yuhuuddu waxay mar hore ku
heshiiyeen in qof uun hadduu u qirto inuu yahay Masiixa,
sunagogga laga saaro. 23 Sidaa aawadeed waalidkiis waxay
ku yidhaahdeen, Waa nin weyn ee weyddiiya isaga. 24
Haddaba mar labaad ayay ninkii indhaha la'aa u yeedheen
oo ku yidhaahdeen, Ilaah ammaan. Waxaannu garanaynaa
inuu ninkanu dembi leeyahaye. 25 Wuxuu haddaba ugu
jawaabay, Inuu dembi leeyahay garan maayo, waxa keli
ahoo aanse garanayaa, inaan indha la'aa, oo aan haddana
wax arkayo. 26 Waxay haddaba ku yidhaahdeen, Muxuu
kugu sameeyey? Sidee buu indhahaaga u furay? 27 Wuxuu
ugu jawaabay, Horaan idiinku sheegay, mana aydnaan
maqlin. Maxaad u doonaysaan inaad mar kale maqashaan?
Idinkuna ma waxaad doonaysaan inaad xertiisa noqotaan?
28 Markaasay caayeen oo waxay ku yidhaahdeen, Adigu
xertiisa baad tahay, annaguse waxaannu nahay xertii Muuse.
29 Waxaannu garanaynaa inuu Ilaah la hadlay Muuse,
laakiinse ninkanu meeshuu ka yimid garan mayno. 30 Ninkii
baa u jawaabay oo ku yidhi, Waxakanu waa yaab inaydnaan
garanaynin meeshuu ka yimid, isaguna uu indhaha ii furay.
31 Waannu garanaynaa inaan Ilaah dembilayaashii maqlayn,
laakiin wuxuu maqlaa kii Ilaah caabuda oo doonistiisa
sameeya. 32 Tan iyo dunida bilowgeedii lama maqlin nin
indhaha u furay qof indhala'aan ku dhashay. **(aiōn g165)**
33 Ninkanu haddaanu xaggii Ilaah ka iman, waxba ma
uu samayn kareen. 34 Markaasay u jawaabeen oo ku
yidhaahdeen, Dhammaantaaba dembiyo waad ku dhalatay
ee ma wax baad na baraysaa? Kolkaasay dibadda ku
tuureen. 35 Ciise ayaa maqlay inay dibadda ku tuureen,
wuuna helay oo ku yidhi, Wiilka Ilaah ma rumaysan tahay?
36 Markaasuu u jawaabay oo ku yidhi, Yuu yahay, Sayidow,
aan rumaystee? 37 Ciise ayaa ku yidhi, Waad aragtay,
waana isaga kan kula hadlayaa. 38 Markaasuu ku yidhi, Waa
rumaysnahay, Sayidow. Wuuna caabuday. 39 Ciise wuxuu
yidhi, Waxaan dunidan u imid xukun, kuwa aan wax arkin
inay wax arkaan, kuwa wax arkaana inay indho beelaan.
40 Kuwii Farrisiinta ahaa oo la joogay ayaa waxyaalahaas
maqlay, oo waxay ku yidhaahdeen, Annaguna ma indha
la' nahay? 41 Ciise ayaa ku yidhi, Haddaad indhala'aan
lahaydeen, dembi ma aydin lahaateen, laakiinse haatan

waxaad tidhaahdaan, Wax baannu aragnaa. Dembigiinnu
waa sii jiraa.

**10** Runtii, runtii, waxaan idinku leeyahay, Kii aan xerada
idaha illinka ka soo gelin ee meel kale ka soo fuulaa,
kaasi waa tuug iyo waxdhace. 2 Laakiin kii illinka ka soo galaa
waa adhijirka idaha. 3 Illinjoogaha ayaa isaga illinka ka fura,
iduhuna codkiisay maqlaan, idihiisana magacyadooda ayuu
ugu yeedhaa, oo dibadduu u kaxeeyaa. 4 Markuu kuwiisa
wada saaro, wuu hor kacaa, iduhuna way raacaan, waayo,
codkiisay garanayaan. 5 Nin qalaadna raaci maayaan,
laakiin way ka cararayaan, waayo, codka kuwa qalaad
garan maayaan. 6 Masaalkaas Ciise ayaa kula hadlay
iyaga, laakiin ma ay garan waxyaaluhuu kala hadlayay
xaggooda. 7 Haddaba Ciise ayaa mar kale ku yidhi, Runtii,
runtii, waxaan idinku leeyahay, Waxaan ahay illinka iduhu
ka soo galaan. 8 Kuwii hortay yimid oo dhammu waa
tuugag iyo waxdhacayaal, iduhuse ma maqlin. 9 Waxaan
ahay illinka, haddii qof uun xaggayga ka soo galo, wuu
badbaadi doonaa, wuuna soo geli doonaa oo bixi doonaa,
daaq buuna heli doonaa. 10 Tuuggu wax kale uma yimaado
inuu wax xado oo dilo oo halleeyo mooyaane, aniguse
waxaan u imid inay nolosha haystaan oo ay badnaan u
haystaan. 11 Waxaan ahay adhijirka wanaagsan. Adhijirka
wanaagsanu wuxuu naftiisa u bixiyaa idaha daraaddood.
12 Kan ciidanka ah oo aan adhijirka ahayn, iduhuna aanay
kuwiisa ahayn, kolkuu arko yeeyda oo soo socota, wuu ka
tagaa idaha oo ka cararaa. Markaasay yeeydu qabsataa oo
kala firdhisaa iyaga. 13 Wuu cararaa, waayo, isagu waa
ciidan uun, oo idaha waxba kama gelin. 14 Waxaan ahay
adhijirka wanaagsan; waan garanayaa kuwayga, kuwayguna
waa i garanayaan, 15 sida Aabbuhu ii garanayo, anna aan
Aabbaha u garanayo; oo naftaydana waan u bixiyaa idaha
daraaddood. 16 Ido kale ayaan leeyahay oo aan kuwa
xeradan ahayn, kuwaasna waa inaan keenaa, waxayna
maqli doonaan codkayga, oo waxaa jiri doona adhi keliya iyo
adhijir keliya. 17 Sidaas daraaddeed Aabbuhu waa i jecel
yahay, waayo, naftaydaan bixiyaa inaan mar kale qaato.
18 Ninna igama qaado, laakiin anaa iska bixiya. Waxaan
leeyahay amar aan ku bixiyo, waanan leeyahay amar aan
haddana ku soo qaato. Amarkan waxaan ka helay Aabbahay.
19 Yuhuuddu haddana way kala qaybsameen hadalladaas
aawadood. 20 Badidood waxay yidhaahdeen, Jinni buu
qabaa, wuuna waalan yahay, ee maxaad u maqlaysaan?
21 Qaar kale waxay yidhaahdeen, Hadalladaasu ma aha
kuwa nin jinni qaba. Jinni miyuu indhaha u furi karaa nin
indha la'? 22 Waxay ahayd Iidda Daahirinta Macbudka
xagga Yeruusaalem, waxayna ahayd wakhtiga qabowga. 23
Ciisena wuxuu dhex socday macbudka xagga Balbalada
Sulaymaan. 24 Yuhuuddu haddaba waxay isugu soo urureen
hareerihiisa oo ku yidhaahdeen, Tan iyo goormaad shaki
nagu sii wadi doontaa? Haddii aad Masiixa tahay bayaan
noogu sheeg. 25 Ciise ayaa ugu jawaabay, Waan idiin
sheegay, idinkuse ma rumaysnidin. Shuqullada aan magaca
Aabbahay ku sameeyo ayaa ii marag fura, 26 laakiin ma
rumaysnidin, waayo, idahayga ka mid ma ihidin. 27 Idahaygu
codkaygay maqlaan, waanan garanayaa iyaga, wayna i
raacaan. 28 Oo waxaan iyaga siiyaa nolosha weligeed
ah, weligoodna ma lumi doonaan, oo ninna kama dhufsan
doono gacantayda. **(aiōn g165, aiōnios g166)** 29 Aabbahaygii
i siiyey iyaga ayaa wax walba ka weyn, oo ninna kama
dhufsan karo gacanta Aabbahay. 30 Aniga iyo Aabbuhu mid
baannu nahay. 31 Markaasay Yuhuuddu haddana dhagaxyo
u gurteen inay dhagxiyaan. 32 Ciise ayaa ugu jawaabay,
Shuqullo badan oo wanaagsan ayaan idinka tusay xagga
Aabbahay. Shuqulladaas kee baad igu dhagxinaysaan?
33 Yuhuuddu waxay ugu jawaabeen, Shuqul wanaagsan
aawadiis kugu dhagxin mayno, laakiin caytanka aawadiis iyo
inaad adigoo nin ah Ilaah iska dhigayso. 34 Ciise wuxuu ugu
jawaabay, Miyaanay ku qorrayn sharcigiinna, Waxaan idhi,
Idinku waxaad tihiin ilaahyo? 35 Hadduu Ilaah kuwii ereygiisu
u yimid ku sheegay ilaahyo (oo Qorniinkana lama jebin karo),
36 ma waxaad ku leedihiin kii Aabbuhu quduus ka dhigay
oo xagga dunida u soo diray, Waad caytantaa, waayo,
waxaan idhi, Wiilka Ilaah baan ahay? 37 Haddaanan samayn
shuqullada Aabbahay, ha i rumaysanina. 38 Laakiin haddaan
sameeyo, in kastoo aydnaan i rumaysanayn, shuqullada
rumaysta, inaad ogaataan oo garataan in Aabbuhu igu jiro,
anna Aabbaha aan ku jiro. 39 Sidaa aawadeed mar kale ayay
dooneen inay qabtaan, wuuna ka baxsaday gacantooda.
40 Haddana wuxuu u baxay Webi Urdun shishadiisa ilaa
meeshii Yooxanaa markii hore ku jiray, isagoo dad ku
baabtiisaya, meeshaasuuna joogay, 41 oo qaar badan baa
u yimid isaga, waxayna ku yidhaahdeen, Runtii Yooxanaa
calaamo ma samayn, laakiin wax walba oo Yooxanaa ka
yidhi ninkan run bay ahaayeen. 42 Kuwa badan baana
halkaa ku rumaystay isaga.

**11** Waxaa jiray nin buka oo ah Laasaros reer Beytaniya
ee joogay tuulada Maryan iyo walaasheed Maarta. 2
Maryantaasu waxay ahayd tii Rabbiga cadar marisay oo
cagihiisa timaheeda ku tirtirtay, oo walaalkeed Laasaros
bukay. 3 Sidaa aawadeed walaalihii farriin bay Rabbiga
u direen iyagoo leh, Sayidow, ogow, kii aad jeclayd waa

bukaaye. 4 Laakiin Ciise markuu taas maqlay wuxuu
yidhi, Bukaankanu kan dhimashada ma ahaa, laakiin waa
ammaanta Ilaah aawadeed in Wiilka Ilaah lagu ammaano. 5
Ciise ayaa jeclaa Maarta iyo walaasheed iyo Laasaros. 6
Sidaa aawadeed markuu maqlay inuu buko, laba maalmood
oo kale ayuu meeshuu joogay iska sii joogay. 7 Markaas
dabadeed ayuu xertii ku yidhi, Yahuudiya aan haddana tagno.
8 Xertii waxay ku yidhaahdeen, Macallimow, Yuhuuddu
waxay haddana doonayeen inay ku dhagxiyaan, ma waxaad
mar kale u kacaysaa meeshaas? 9 Ciise ayaa ugu jawaabay,
Maalintu miyaanay laba iyo toban saacadood ahayn? Qof
hadduu maalinta socdo ma turunturoodo, waayo, wuxuu
arkaa iftiinka dunidan. 10 Laakiin qof hadduu habeenka
socdo, wuu turunturoodaa, waayo, iftiinku kuma jiro isaga.
11 Waxyaalahaas ayuu ku hadlay, oo dabadeedto wuxuu
ku yidhi iyaga, Saaxiibkeen Laasaros waa hurdaa, laakiin
waan u tegayaa inaan soo toosiyo. 12 Sidaa daraaddeed
xertii waxay ku yidhaahdeen, Sayidow, hadduu hurdo wuu
bogsanayaa. 13 Ciise wuxuu ka hadlayay dhimashadiisa,
iyaguse waxay u maleeyeen inuu ka hadlayo nasashada
hurdada. 14 Ciise haddaba ayaa bayaan ugu yidhi, Laasaros
waa dhintay. 15 Anigu waa ku faraxsanahay aawadiin
inaanan halkaas joogin si aad u rumaysataan, laakiin aan u
tagno. 16 Sidaa aawadeed Toomas, kii Didumos la odhan
jiray, wuxuu ku yidhi xertii la socotay, Innaguna aan tagno
si aynu ula dhimanno. 17 Haddaba markuu Ciise yimid
wuxuu ogaaday inuu afar maalmood xabaasha ku jiray. 18
Haddana Beytaniya waa u dhowayd Yeruusaalem, oo waxay
u jirtay qiyaas shan iyo toban istaadiyon. 19 Yuhuud badan
waxay u yimaadeen Maarta iyo Maryan inay walaalkood uga
tacsiyeeyaan. 20 Maarta haddaba markay maqashay in Ciise
imanayo, ayay ka hor tagtay, Maryanse gurigay iska fadhiday.
21 Markaasaa Maarta waxay Ciise ku tidhi, Sayidow, haddaad
halkan joogtid, walaalkay ma uu dhinteen. 22 Hadda waxaan
garanayaa in wax alla waxaad Ilaah weyddiisatid uu ku
siinayo. 23 Markaasaa Ciise wuxuu ku yidhi, Walaalkaa waa
sara kici doonaa. 24 Maartaa ku tidhi, Waan garanayaa inuu
kici doono wakhtiga sarakicidda ee maalinta u dambaysa.
25 Ciise ayaa ku yidhi, Anigu waxaan ahay sarakicidda iyo
nolosha. Kii i rumaystaa, in kastoo uu dhinto, wuu noolaan
doonaa. 26 Kii kasta oo nool oo i rumaystaa weligii ma
dhiman doono. Waxan ma rumaysan tahay? **(aiōn g165)** 27
Waxay ku tidhi, Haah, Sayidow, waan rumaysnahay inaad
tahay Masiixa oo ah Wiilka Ilaah ee dunida iman lahaa.
28 Markay taas tidhi, way tagtay oo hoos ahaan ugu soo
yeedhay walaasheed Maryan, oo waxay ku tidhi, Macallinkii
halkan buu joogaa, waana kuu yeedhayaa. 29 Iyaduna kolkay
maqashay, dhaqso bay u kacday oo u tagtay. 30 Ciise weli ma
iman tuulada, laakiin wuxuu weli joogay meeshii Maarta kaga
hor tagtay. 31 Haddaba Yuhuuddii iyada guriga la joogtay oo
u tacsiyaynaysay, markay arkeen Maryan inay dhaqso u
kacday oo baxday, ayay raaceen, iyagoo u malaynaya inay
xabaashii tegayso inay meeshaas ku baroorato. 32 Haddaba
Maryan markay timid meeshii Ciise joogay oo ay aragtay
isaga, waxay ku dhacday cagihiisa iyadoo ku leh, Sayidow,
haddaad halkan joogtid, walaalkay ma uu dhinteen. 33 Ciise
haddaba markuu arkay iyadoo barooranaysa, iyo Yuhuuddii
la socotay oo la barooranaysa, ayuu ka qalbi xumaaday,
wuuna murugooday. 34 Markaasuu yidhi, Xaggee baad
dhigteen? Waxay ku yidhaahdeen, Sayidow, kaalay oo arag.
35 Ciise waa ooyay. 36 Sidaa daraaddeed Yuhuuddu waxay
yidhaahdeen, Bal eega, siduu u jeclaa. 37 Qaarkoodse
waxay yidhaahdeen, Ninkan oo indhaha u furay kii indha
la'aa, miyuusan wax ka samayn karin inuusan ninkaasu
dhiman? 38 Sidaa daraaddeed Ciise oo mar kale qalbi
xumaaday ayaa xabaashii yimid. Waxay ahayd god, dhagax
baana saarnaa. 39 Ciise ayaa yidhi, Dhagaxa ka qaada.
Maarta oo ahayd kii dhintay walaashiis, waxay ku tidhi,
Sayidow, hadda wuu urayaa, waayo, afar maalmood buu
mootanaa. 40 Ciise wuxuu ku yidhi, miyaanan kugu odhan,
Haddaad rumaysatid, waxaad arki lahayd ammaanta Ilaah?
41 Markaasay dhagaxii ka qaadeen. Ciisena indhihiisuu kor u
taagay oo yidhi, Aabbow, waan kuugu mahadnaqayaa inaad
i maqashay. 42 Waana ogaa inaad mar kasta i maqasho,
laakiin dadkan badan oo hareerahayga taagan aawadood
ayaan taas u idhi inay rumaystaan inaad adigu i soo dirtay.
43 Markuu sidaas ku hadlay dabadeed wuxuu ku dhawaaqay
cod weyn, Laasarosow, soo bax. 44 Markaasaa kii dhintay
soo baxay, isagoo gacmaha iyo cagaha ay kafan kaga xidhan
tahay, wejigana maro kaga xidhan tahay. Kolkaasuu Ciise
wuxuu ku yidhi iyaga, Fura oo daaya, ha socdee. 45 Sidaa
aawadeed qaar badan oo Yuhuuddii ah oo Maryan u yimid
oo arkay wuxuu sameeyey ayaa rumaystay. 46 Qaarkoodse
way u tageen Farrisiintii, oo waxay u sheegeen wuxuu
Ciise sameeyey. 47 Sidaa aawadeed wadaaddadii sare
iyo Farrisiintii shir bay isugu yimaadeen oo yidhaahdeen,
Maxaynu samaynaa? Waayo, ninkanu calaamooyin badan
buu sameeyeye. 48 Haddaynu sidaa u dayno, dhammaan
way rumaysan doonaan isaga, oo dadka Roomana way
iman doonaan, oo waxay qaadan doonaan meesheenna
iyo quruunteenna. 49 Midkood Kayafas la odhan jiray, oo
wadaadka sare ahaa sannaddaas, wuxuu iyagii ku yidhi,
Waxba garan maysaan, 50 oo ka fiirsan maysaan inay idiin
roon tahay in nin keli ahu dadka u dhinto oo aan quruunta

oo dhammu lumin. 51 Waxaas iskama odhan, laakiin isagoo
ah wadaadka sare sannaddaas, wuxuu sii sheegay in Ciise
quruunta u dhiman doono, 52 quruuntii oo keliya uma aha,
laakiin inuu mid keliya isugu soo ururiyo carruurtii Ilaah oo
kala firidhsan. 53 Haddaba maalintaas wixii ka dambeeyey
waxay ku tashadeen inay dilaan. 54 Sidaa daraaddeed mar
dambe Ciise bayaan uma dhex marin Yuhuudda, wuuse ka
tegey meeshaas, ilaa meel u dhowayd cidlada, ilaa magaalo
la yidhaahdo Efrayim, halkaasuuna xertii la joogay. 55 Hadda
Iidda Yuhuudda ee Kormaridda la yidhaahdaa waa dhowayd,
kuwa badanna waxay u kaceen Yeruusaalem iyagoo dalka
ka yimid Iiddii Kormaridda horteed inay isdaahiriyaan. 56
Sidaa daraaddeed ayay Ciise doondooneen, oo waxay isku
yidhaahdeen, iyagoo macbudka dhex taagan, Maxay idinla
tahay? Ma inuusan iidda imanaynin baa? 57 Wadaaddadii
sare iyo Farrisiintii waxay amar ku bixiyeen, Hadduu qof
ogaado meeshuu joogo waa inuu sheego, ha la qabtee.

**12** Haddaba lix maalmood ka hor Iidda Kormaridda, Ciise
wuxuu yimid Beytaniya, meeshuu joogay Laasaros,
kii Ciise kuwa dhintay ka soo sara kiciyey. 2 Sidaas
daraaddeed halkaasaa casho loogu sameeyey, Maartana
waa adeegaysay, oo Laasaros wuxuu ka mid ahaa kuwa
cuntada ula fadhiistay. 3 Maryan haddaba waxay qaadday
rodol cadar ah oo naaradiin qaaliya ah, waxayna marisay
cagaha Ciise, oo timaheedii ayay cagihiisa ku tirtirtay.
Gurigiina waxaa ka buuxsamay udgoonkii cadarka. 4 Laakiin
Yuudas Iskariyod, oo ahaa mid xertiisii ka mid ah, oo
gacangelin lahaa, wuxuu yidhi, 5 Maxaa cadarkan loogu
iibin waayay saddex boqol oo dinaar, oo loo siin waayay
masaakiinta? 6 Sidaas uma uu odhan dan uu ka lahaa
masaakiinta, laakiin wuxuu u yidhi wuxuu ahaa tuug, oo
kiishadda lacagta ayuu hayn jiray, wuuna kala bixi jiray
wixii lagu rido. 7 Haddaba Ciise ayaa yidhi, Daaya. Waxay
u haysay maalinta aasniintayda. 8 Waayo, masaakiintu
mar walba way idinla jiraan, aniguse idinlama joogo mar
walba. 9 Haddaba dad badan oo Yuhuud ah baa waxay
ogaadeen inuu halkaas joogo, wayna u yimaadeen, ma aha
Ciise aawadii oo keliya laakiin inay arkaan Laasarosna,
kii uu kuwii dhintay ka soo sara kiciyey. 10 Wadaaddadii
sare waxay ku tashadeen inay Laasarosna dilaan. 11
Waayo, aawadiis ayaa Yuhuud badani ku tagtay oo Ciise
rumaysatay. 12 Maalintii xigtay dad badan oo u yimid iiddii,
markay maqleen inuu Ciise Yeruusaalem imanayo, 13 waxay
qaateen laamihii geedaha timirta ah, oo ay baxeen inay
ka hor tagaan, iyagoo ku dhawaaqaya Hoosanna, waxaa
barakaysan kan Rabbiga magiciisa ku imanaya oo boqorka
Israa'iil ah. 14 Ciise wuxuu helay dameer yar oo fuulay, siday
ugu qoran tahay, 15 Ha biqin, gabadhii Siyoonay; bal eeg,
Boqorkaagu waa imanayaa isagoo fuushan qayl dameereed.
16 Markii hore xertiisii waxyaalahaas ma ay garan, laakiin
markii Ciise ammaanmay dabadeed ayay xusuusteen in
waxyaalahaas xaggiisa laga qoray iyo in waxyaalahaas
lagu sameeyey isaga. 17 Haddaba waxaa marag furay
dadkii badnaa ee la joogay markuu Laasaros xabaasha uga
yeedhay oo uu kuwa dhintay ka soo sara kiciyey. 18 Sidaa
daraaddeed dadkii badnaa waa u kaceen inay ka hor tagaan,
waayo, waxay maqleen inuu calaamadaas sameeyey. 19
Haddaba Farrisiintii waxay dhexdoodii isku yidhaahdeen,
Waad arkaysaan sidaydnaan waxba u taraynin. Eega, dunidii
oo dhan baa raacdaye. 20 Kuwa wakhtiga iidda u kacay
inay Ilaah caabudaan, waxaa ku dhex jiray qaar Gariig ah.
21 Kuwaas haddaba waxay u yimaadeen Filibos oo ahaa
reer Beytsayda ee Galili, wayna weyddiisteen oo waxay ku
yidhaahdeen, Sayidow, waxaannu doonaynaa inaannu Ciise
aragno. 22 Markaasaa Filibos u yimid oo Andaros u sheegay,
oo haddana Andaros iyo Filibos baa wada yimid, oo ay Ciise
u sheegeen. 23 Kolkaasaa Ciise u jawaabay, oo wuxuu ku
yidhi, Saacaddii way timid uu Wiilka Aadanahu ammaanmi
lahaa. 24 Runtii, runtii, waxaan idinku leeyahay, Xabbad
sarreen ah haddaanay dhulka ku dhicin oo dhiman, keligeed
bay iska jiraysaa, laakiin hadday dhimato, midho badan bay
dhashaa. 25 Kan naftiisa jecel, waa lumiyaa, kan dunidan
naftiisa ku nebcaadaase, wuu hayn doonaa tan iyo nolosha
weligeed ah. (aiōnios g166) 26 Qof uun hadduu ii adeego, ha i
soo raaco, meeshaan joogona, midiidinkayguna wuu joogi
doonaa. Qof uun hadduu ii adeego, Aabbuhu waa murwayn
doonaa isaga. 27 Haatan naftaydu waa murugootay, oo
maxaan idhaahdaa? Aabbow, saacaddan iga badbaadi.
Laakiin taas aawadeed ayaan saacaddan u soo gaadhay. 28
Aabbow, magacaaga ammaan. Haddaba waxaa samada ka
yimid cod leh, Waan ammaanay, waanan ammaani doonaa
mar kale. 29 Haddaba dadkii badnaa oo ag taagnaa, way
maqleen, oo waxay yidhaahdeen, Waa onkod. Qaar kale
waxay yidhaahdeen, Malaa'ig baa la hadashay isaga. 30
Ciise ayaa u jawaabay oo ku yidhi, Codkaasu aawaday uma
imanin, laakiin wuxuu u yimid aawadiin. 31 Imminka weeye
markii dunidan la xukumi lahaa, imminka kan madaxda
dunida ah dibaddaa lagu tuuri doonaa. 32 Aniguna haddii
kor layga qaado dhulka, dhammaan xaggaygaan u soo jiidi
doonaa. 33 Wuxuu waxaas u yidhi inuu tuso siduu u dhiman
doono. 34 Haddaba dadkii badnaa waxay ugu jawaabeen,
Waxaannu sharciga ka maqallay in Masiixu weligiis jiri
doono. Sidee baad u leedahay, Wiilka Aadanaha waa in

kor loo qaado? Waa ayo Wiilka Aadanahu? (aiōn g165) 35
Ciise haddaba ayaa ku yidhi, Weli in yar nuurka ayaa idinla
jiraya. Socda intaad nuurka haysataan, si aan gudcurku
idiin soo gaadhin. Kan gudcurka ku socdaana ma yaqaan
meeshuu u socdo. 36 Intaad nuurka haysataan, rumaysta
nuurka, inaad noqotaan wiilasha nuurka. Waxyaalahaas
Ciise ayaa ku hadlay, markaasuu ka tegey oo ka dhuuntay
iyaga. 37 Laakiin in kastuu calaamooyin badan ku sameeyey
hortooda, weli ma ay rumaysan isaga; 38 inuu noqdo hadalka
nebi Isayos oo uu ku hadlay, Rabbiyow, yaa warkayagii
rumaystay, Oo yaa gacantii Rabbiga loo muujiyey? 39 Sidaa
aawadeed ayay rumaysan kari waayeen, waayo, Isayos
ayaa haddana yidhi, 40 Wuu indhatiray, qalbigoodana ayuu
engejiyey, Si aanay indhahooda wax ugu arkin, oo aanay
qalbigoodana wax ugu garan, Oo aanay u soo noqon, Oo
aanan u bogsiin. 41 Waxyaalahaas Isayos ayaa yidhi, maxaa
yeelay, ammaantiisuu arkay, wuuna ka hadlay isaga. 42
Hase ahaatee qaar badan oo taliyayaasha ka mid ahaa way
rumaysteen, laakiin Farrisiintii aawadood ma ay qiran si aan
sunagogga looga saarin, 43 waayo, waxay ammaanta Ilaah
ka jeclaayeen ammaanta dadka. 44 Ciise ayaa ku dhawaaqay
oo yidhi, Kii i rumaystaa, ima rumaysto, wuxuuse rumaystaa
kan i soo diray. 45 Kii i arkaana, wuxuu arkaa kan i soo
diray. 46 Waxaan dunida u imid inaan nuur u ahaado, in mid
kasta oo i rumaystaa uusan gudcurka ku sii jirin. 47 Nin uun
hadduu erayadayda maqlo oo uusan xajin, xukumi maayo,
waayo, uma iman inaan dunida xukumo, waxaanse u imid
inaan dunida badbaadiyo. 48 Kii i diida oo aan erayadayda
aqbalin, wuxuu haystaa mid xukuma; ereygaan ku hadlay
baa xukumi doona isaga maalinta u dambaysa. 49 Waayo,
anigu amarkayga kuma hadlin, laakiinse Aabbihii i soo diray
isagaa i amray waxaan idhaahdo iyo waxaan ku hadloba.
50 Oo waanan garanayaa inuu amarkiisu yahay nolosha
weligeed ah. Sidaa daraaddeed waxaan ku hadlayaa, sidii
Aabbuhu igu yidhi, sidaasaan ku hadlayaa. (aiōnios g166)

13 Iidda Kormaridda horteed Ciise wuxuu garanayay
inay timid saacaddiisii uu dunidan ka tegi lahaa ilaa
Aabbaha, oo siduu u jeclaa kuwiisii dunida joogay, ayuu
u jeclaa tan iyo dhammaadka. 2 Ibliiska ayaa markii hore
qalbiga Yuudas Iskariyod ina Simoon geliyey inuu Ciise
gacangeliyo. 3 Oo wakhtiga cashada Ciise oo garanaya
in Aabbuhu wax walba gacanta u geliyey iyo inuu Ilaah ka
yimid oo Ilaah ku noqonayo, 4 ayuu cashadii ka kacay oo
dharkii iska dhigay, tuwaalna wuu qaatay oo guntaday. 5
Markaasuu biyo weel ku shubay oo bilaabay inuu xertiisa
cagaha u maydho oo ku tirtiro tuwaalkii uu guntanaa. 6
Wuxuu haddaba u yimid Simoon Butros. Kaasaa ku yidhi,
Sayidow, ma adaa cagaha ii maydhaya? 7 Markaasaa Ciise
u jawaabay oo ku yidhi, Waxaan samaynaya, garan maysid
imminka, laakiinse dabadeed waad garan doontaa. 8 Butros
ayaa ku yidhi, Weligaa cagaha ii maydhi maysid. Ciise wuxuu
ugu jawaabay, Haddaanan kuu maydhin, qayb iguma lihid.
(aiōn g165) 9 Markaasaa Simoon Butros ku yidhi, Sayidow,
cagaha keliya ha ii maydhin, laakiin gacmaha iyo madaxana ii
maydh. 10 Ciise ayaa ku yidhi, Kii maydhni uma baahna inuu
maydho cagihiisa mooyaane, laakiin waa wada nadiifsan
yahay, idinkuna waa nadiifsan tihiin, laakiin dhammaantiin
ma aha. 11 Waayo, wuu garanayay kii gacangelin lahaa.
Sidaa daraaddeed ayuu u yidhi, Dhammaantiin ma wada
nadiifsanidin. 12 Haddaba markuu cagihii u maydhay iyagii,
oo dharkiisa qaatay, oo haddana fadhiistay, markaasuu
ku yidhi, Ma garanaysaan waxaan idinku sameeyey? 13
Waxaad iigu yeedhaan, Macallin iyo Sayid, waadna ku
hagaagsan tihiin, waayo, waan ahay. 14 Haddaba haddaan
cagaha idiin maydhay anigoo ah Sayidka iyo Macallinka,
idinkuna waa inaad cagaha isu maydhaan. 15 Waxaan idin
siiyey masaal inaad samaysaan sidaan idinku sameeyey. 16
Runtii, runtii, waxaan idinku leeyahay, Addoon kama weyna
sayidkiis, mid la soo dirayna kama weyna kii soo diray.
17 Haddaad waxyaalahan garanaysaan, waad barakaysan
tihiin haddaad yeeshaan. 18 Dhammaantiin ka hadli maayo;
waan garanayaa kuwaan doortay. Laakiin Qorniinka leh, Kan
kibistayda cuna ayaa cedhibtiisa ii qaaday, waa inuu ahaado.
19 Hadda dabadeed waxaas ayaan idiin sheegayaa intaanay
dhicin, in markay dhacaan aad rumaysataan inaan ahay
isagii. 20 Runtii, runtii, waxaan idinku leeyahay, Kan aqbala
ku alla kaan soo diro ayaa i aqbala, oo kan i aqbalaana
wuxuu aqbalaa kii i soo diray. 21 Ciise markuu sidaas
yidhi, ayuu ka qalbi xumaaday, wuxuuna bayaan u sheegay
oo yidhi, Runtii, runtii, waxaan idinku leeyahay, Midkiin
ayaa i gacangelin doona. 22 Markaasay xertii is-eegeegeen
iyagoo aan garanaynin kii uu ka hadlayay. 23 Waxaa joogay
oo laabta Ciise ku tiirsanaa xertiisa midkood oo uu Ciise
jeclaa. 24 Sidaa daraaddeed ayaa Simoon Butros calaamo u
sameeyey oo ku yidhi, Noo sheeg yuu yahay kan uu ka
hadlayo. 25 Isagoo sidii ugu tiirsan laabta Ciise, ayuu ku yidhi,
Sayidow, waa kuma? 26 Markaasaa Ciise ugu jawaabay,
Waa kii aan koosaarta u dari doono oo aan siin doono.
Haddaba markuu koosaarta u daray ayuu qaaday oo siiyey
Yuudas Iskariyod ina Simoon. 27 Markuu koosaarta qaatay
dabadeed, Shayddaan baa galay isagii. Sidaa daraaddeed
Ciise wuxuu ku yidhi, Waxaad samaynayso dhaqso u
samee. 28 Kuwa la fadhiyey midkoodna ma garanaynin

sababta uu sidaas ugula hadlay isaga. 29 Yuudas baa
kiishaddii lacagta hayay, taas aawadeed qaar waxay u
maleeyeen in Ciise ku yidhi, Soo iibi waxaynu iidda u baahan
nahay, ama, Masaakiinta wax sii. 30 Isagu haddaba markuu
koosaartii qaatay, markiiba ayuu baxay, oo waxayna ahayd
habeennimo. 31 Haddaba markuu baxay, Ciise ayaa yidhi,
Hadda Wiilka Aadanahu waa ammaanmay, Ilaahna waa ku
ammaanmay isaga. 32 Haddii Ilaahu ku ammaanmay isaga,
Ilaahna waa ammaani doonaa isaga qudhiisa, oo markiiba
wuu ammaani doonaa. 33 Carruur yahay yaryari, weli in yar
baan idinla joogayaa. Waad i dooni doontaan, oo sidaan
Yuhuuddii ku idhi, Meeshaan tegayo iman kari maysaan,
idinkana hadda sidaasaan idinku leeyahay. 34 Waxaan idin
siinayaa qaynuun cusub oo ah, Waa inaad isjeclaataan;
sidaan idiin jeclaaday, idinkuna waa inaad isu jeclaataan. 35
Sidaasay dadka oo dhammi idinku garan doonaan inaad
xertaydii tihiin, haddaad jacayl isu qabtaan. 36 Simoon
Butros ayaa ku yidhi, Sayidow, xaggee baad tegaysaa?
Ciise wuxuu ugu jawaabay, Meeshaan tegayo hadda ii raaci
kari maysid, laakiin mar dambe waad i soo raaci doontaa. 37
Butros ayaa ku yidhi, Sayidow, maxaan hadda kuu raaci
kari waayay? Naftaydaan aawadaa u bixin doonaaye. 38
Ciise ayaa ugu jawaabay, Miyaad naftaada u bixin doontaa
aawaday? Runtii, runtii, waxaan kugu leeyahay, Diiqu ciyi
maayo ilaa aad saddex kol i dafirtid.

**14** Qalbigiinnu yuusan murugoon. Ilaah waad rumaysan
tihiin, anigana i rumaysta. 2 Guriga Aabbahay wuxuu
leeyahay hoyaal badan. Haddaanay sidaas ahayn waan idiin
sheegi lahaa, maxaa yeelay, waxaan u tegayaa inaan meel
idiin sii diyaariyo. 3 Oo haddaan tago oo meel idiin diyaariyo,
mar dambe waan soo noqon doonaa, oo xaggaygaan idiin
qaadan doonaa, in meeshaan joogo, idinkuna aad joogtaan.
4 Oo meeshaan tegayo iyo jidkaba waad taqaaniin. 5
Toomas ayaa ku yidhi, Sayidow, ma naqaan meeshaad
tegaysid ee sidee baan ku naqaan jidka? 6 Markaasaa Ciise
wuxuu Toomas ku yidhi, Anigu waxaan ahay jidka iyo runta
iyo nolosha. Ninna Aabbaha uma yimaado, xaggayguu ku
yimaado maahee. 7 Haddaad i garateen, Aabbahayna waad
garan lahaydeen. Hadda ka dib waad garanaysaan, waadna
aragteen. 8 Filibos baa ku yidhi, Sayidow, Aabbaha na tus,
waana nagu filan yahay. 9 Markaasaa Ciise wuxuu ku yidhi,
Ma intaas badan baan idinla joogay, oo aanad i garanaynin,
Filibosow? Kii i arkay wuxuu arkay Aabbaha. Sidee baad u
leedahay, Aabbaha na tus? 10 Miyaadan rumaysan inaan
Aabbaha ku jiro, Aabbuhuna uu igu jiro? Erayadaan idinkula
hadlayo, anigu iskagama hadlayo, Aabbahase igu jira ayaa
shuqulladiisa sameeya. 11 I rumaysta inaan Aabbaha ku
jiro, oo Aabbuhuna aniga igu jiro, haddii kale shuqullada
aawadood ii rumaysta. 12 Runtii, runtii, waxaan idinku
leeyahay, Kii i rumaystaa, shuqullada aan sameeyo, isna
wuu samayn doonaa, oo shuqullo kuwan ka waaweynna
wuu samayn doonaa, maxaa yeelay, Aabbahaan u tegayaa.
13 Oo wax alla waxaad magacayga ku weyddiisataan, waan
samayn doonaa in Aabbuhu ku ammaanmo Wiilka. 14 Haddii
aad wax igu weyddiisataan magacayga, waan samayn
doonaa. 15 Haddii aad i jeceshihiin, qaynuunnadayda waad
xajin doontaan. 16 Aniguna Aabbahaan baryi doonaa, isna
wuxuu idin siin doonaa Gargaare kale inuu idinla jiro weligiin,
**(aiōn g165)** 17 waxaa weeye, Ruuxa runta ah oo aanay
dunidu qaadan karin, waayo, ma aragto, garanna mayso,
idinkuse waad garanaysaan, waayo, wuu idinla jiraa, wuuna
idinku jiri doonaa. 18 Idiinkama tegi doono agoonnimo,
ee waan idiin imanayaa. 19 In yar dabadeed dunidu i
arki mayso mar dambe, idinkuse waad i arkaysaan. Waan
noolahay, taas aawadeed idinkuna waad noolaan doontaan.
20 Maalintaas waxaad garan doontaan inaan Aabbahay
ku jiro, idinna aad igu jirtaan, anna aan idinku jiro. 21 Kii
qaynuunnadayda haysta oo xajiya, waa kaas kan i jecel,
kan i jecelna Aabbahay waa jeclaan doonaa, anna waan
jeclaan doonaa, waana isu muujin doonaa isaga. 22 Yuudas
(Yuudas Iskariyod ma aha) ayaa ku yidhi isaga, Sayidow,
maxaa dhacay oo annaga aad isugu kaaya muujin doontaa,
dunidana aadan isugu muujin doonin? 23 Ciise ayaa u
jawaabay oo ku yidhi, Haddii nin i jecel yahay, ereygayguu
xajin doonaa, Aabbahayna waa jeclaan doonaa, oo waannu
u iman doonnaa, waanna la joogi doonnaa. 24 Kii aan
i jeclayn, ereygayga ma xajiyo: ereygaad maqlaysaanna
kayga ma aha, laakiin waxaa leh Aabbaha i soo diray. 25
Waxyaalahaas ayaan idinkula hadlay intaan idinla joogay, 26
laakiin Gargaaraha Ruuxa Quduuska ah oo Aabbuhu ku soo
diri doono magacayga, wax kasta ayuu idin bari doonaa,
wuxuuna idin xusuusin doonaa wax kasta oo aan idinku
idhi. 27 Nabad baan idiinka tegayaa, nabaddaydana waan
idin siinayaa, sida dunidu u siiso anigu idiin siin maayo.
Qalbigiinnu yuusan murugoon, yuusanna biqin. 28 Waad
maqasheen inaan idinku idhi, Waan tegayaa, waanan idiin
imanayaa. Haddaad i jeclaateen, waad farxi lahaydeen,
waayo, Aabbahaan u tegayaa, maxaa yeelay, Aabbuhu waa
iga weyn yahay. 29 Haatan waxaan idiinku sheegay intaanay
dhicin, in markay dhacaan aad rumaysataan. 30 Mar dambe
wax badan idinlama sii hadli doono, maxaa yeelay, kan
madaxda dunida ahu wuu imanayaa, isaguna waxba iguma
laha. 31 Laakiin tani waa in dunidu ku garato inaan Aabbaha

jeclahay iyo inaan sameeyo sida Aabbuhu igu amray. Kaca,
aynu meeshan ka tagnee.

**15** Anigu waxaan ahay geedka canabka ah oo runta ah;
Aabbahayna waa beerfalaha. 2 Laan walba oo igu taal
oo aan midho dhalin, wuu gooyaa, oo mid kasta oo midho
dhasha ayuu nadiifiyaa si ay midho ka sii badan u dhasho.
3 Durba waad nadiifsan tihiin hadalkaan idinkula hadlay
daraaddiis. 4 Igu jira, anna aan idinku jiree. Sida laantu
keligeed aanay midho u dhali karin haddaanay geedka
canabka ah ku oollin, sidaas oo kale idinkuna ma dhali
kartaan haddaydnan igu jirin. 5 Anaa ah geedka canabka ah,
idinna waxaad tihiin laamihii. Kii igu jira oo anna aan ku jiro,
kaasaa midho badan dhala, maxaa yeelay, la'aantay waxba
ma samayn kartaan. 6 Qof uun hadduusan igu jirin waxaa
loo tuuraa sida laan oo kale, waana qallalaa, markaasaa la
ururiyaa, oo dabka lagu tuuraa, oo la gubaa. 7 Haddaad
igu jirtaan, oo ay erayadayduna idinku jiraan, weyddiista
waxaad doonaysaanba, waana laydiin yeeli doonaa. 8 Waxaa
Aabbahay ku ammaanmaa inaad midho badan dhashaan,
waxaadna noqon doontaan xertayda. 9 Siduu Aabbuhu ii
jeclaaday, ayaan anna idiin jeclaaday. Jacaylkayga ku sii jira.
10 Haddaad qaynuunnadayda xajisaan, jacaylkaygaad ku
jiri doontaan, sidaan qaynuunnada Aabbahay u xajiyey, oo
aan jacaylkiisa ugu jiro. 11 Waxaan waxyaalahaas idiinkula
hadlay in farxaddaydu idinku jirto, iyo inay farxaddiinnu
buuxsanto. 12 Kanu waa qaynuunkayga inaad isjeclaataan
sidaan idiin jeclaaday. 13 Ninna ma leh jacayl kan ka weyn
inuu nin naftiisa u bixiyo saaxiibbadiis. 14 Saaxiibbaday
baad tihiin haddaad yeeshaan waxaan idinku amro. 15 Mar
dambe addoommo idiinku yeedhi maayo, maxaa yeelay,
addoonku garan maayo wuxuu sayidkiisu sameeyo, laakiin
saaxiibbo waan idiinku yeedhay, maxaa yeelay, waxaan
Aabbahay ka soo maqlay oo dhan ayaan idin ogeysiiyey.
16 Idinku ima aydnaan dooran, laakiinse anaa idin doortay,
waanan idiin diray inaad tagtaan oo midho soo dhashaan,
iyo in midhihiinnu sii jiraan, in wax alla waxaad Aabbaha
magacayga ku weyddiisataan uu idin siiyo. 17 Waxyaalahaas
ayaan idiinku amray inaad isjeclaataan. 18 Dunidu hadday
idin nebcaato, waad garanaysaan inay hortiin i nebcaatay.
19 Haddaad kuwa dunida ahaan lahaydeen, dunidu kuweeda
way jeclaan lahayd, laakiin kuwa dunida ma ihidin, waanse
idinka doortay dunida, taas aawadeed dunidu way idin
neceb tahay. 20 Xusuusta hadalkaan idinku idhi, Addoon
kama weyna sayidkiisa. Hadday i silciyeen, idinkana way
idin silcin doonaan. Hadday hadalkayga xajiyeen, kiinnana
way xajin doonaan. 21 Laakiin waxyaalahaas oo dhan
waxay idiinku samayn doonaan magacayga aawadii, maxaa
yeelay, waxaanay garanayn kii i soo diray. 22 Haddaanan
iman oo aanan la hadlin, dembi ma ay lahaadeen, laakiin
hadda dembigooda marmarsiinyo uma haystaan. 23 Kii i
neceb, waxaa kaluu neceb yahay Aabbahay. 24 Haddaanan
dhexdooda ku samayn shuqullada aan nin kale samayn,
dembi ma ay lahaadeen, haddase aniga iyo Aabbahayba
way na arkeen oo na nebcaadeen. 25 Laakiin sidaas waxay
u noqotay inuu dhammaado hadalka sharcigooda ku qorani,
Way ii nebcaadeen sababla'aan. 26 Laakiin markuu yimaado
Gargaaraha oo aan xagga Aabbaha ka soo diri doono,
isagoo ah Ruuxa runta oo xagga Aabbaha ka soo baxa,
ayuu ii marag furi doonaa. 27 Idinkuna waad marag furi
doontaan, waayo, tan iyo bilowgii waad ila jirteen.

**16** Waxaan waxyaalahaas idiinkula hadlay inaydnaan ka
xumaanin. 2 Waxay idinka saari doonaan sunagogyada,
weliba saacaddaa imanaysa in mid walboo idin dilaa uu u
malaynayo inuu Ilaah u adeegayo. 3 Oo waxay waxyaalahaas
u samayn doonaan, waayo, waxaanay garanayn Aabbaha iyo
aniga toona. 4 Laakiin waxaan waxyaalahaas idiinkula hadlay
in markii saacaddoodu timaado aad xusuusataan inaan
idiin sheegay. Tan iyo bilowgii waxyaalahaas idinkulama
hadlin, maxaa yeelay, waan idinla joogay. 5 Laakiin hadda
waxaan u tegayaa kii i soo diray, midkiinna i weyddiin maayo,
Xaggee baad tegaysaa? 6 Waxyaalahaas aan idinkula
hadlay aawadood, qalbigiinna murug baa ka buuxsantay.
7 Laakiin runta ayaan idiin sheegayaa, Waxaa idiin roon
inaan tago. Haddaanan tegin, Gargaaruhu idiinma iman
doono, laakiin haddaan tago waan idiin soo diri doonaa. 8
Isagu markuu yimaado wuxuu dunida ku caddayn doonaa
xagga dembiga iyo xaqa iyo xukunka; 9 xagga dembiga,
waayo, way i rumaysan waayeen; 10 xagga xaqa, waayo,
Aabbahaan u tegayaa, imana arki doontaan mar dambe;
11 xagga xukunka, waayo, kan madaxda dunida ah waa la
xukumay. 12 Wax badan oo kalaan leeyahay inaan idiin
sheego, laakiin imminka qaadi kari maysaan. 13 Laakiin
markuu kan Ruuxa runta ahu yimaado, wuxuu idinku wadi
doonaa runta oo dhan, waayo, isagu iskama hadli doono,
wuxuuse ku hadli doonaa wuxuu maqlo, wuxuuna idiin
sheegi doonaa waxa imanaya. 14 Wuu i ammaani doonaa,
waayo, waxayguu qaadi doonaa, wuuna idiin sheegi doonaa.
15 Wax kasta oo Aabbuhu leeyahay anigaa leh. Sidaa
daraaddeed waxaan idhi, Waxayguu qaadaa, wuuna idiin
sheegi doonaa. 16 In yar dabadeed i arki maysaan, oo
weliba in yar dabadeed waad i arki doontaan. 17 Sidaa
daraaddeed xertiisa qaarkood waxay isku yidhaahdeen, Waa
maxay waxan uu inagu leeyahay, In yar dabadeed i arki

maysaan, oo weliba in yar dabadeed waad i arki doontaan,
iyo, Maxaa yeelay, Aabbahaan u tegayaa? 18 Haddaba
waxay yidhaahdeen, Waa maxay waxan uu leeyahay, In
yar dabadeed? Garan mayno wuxuu leeyahay. 19 Ciise
ayaa garanayay inay doonayeen inay wax weyddiiyaan,
oo wuxuu ku yidhi, Ma waxaad isweyddiinaysaan xaalkan
aan idhi, In yar dabadeed i arki maysaan, oo weliba in yar
dabadeed waad i arki doontaan? 20 Runtii, runtii, waxaan
idinku leeyahay, Waad ooyi doontaan oo barooran doontaan,
duniduse waa farxi doontaa. Waad murugoon doontaan,
laakiin murugaddiinnu waxay u rogman doontaa farxad.
21 Naagtu goortay umulayso, way murugootaa, waayo,
saacaddeedaa timid, laakiin markay ilmaha umusho, dhibtii
dib uma xusuusato farxad aawadeed, waayo, nin baa dunida
ku dhashay. 22 Haddaba waad murugsan tihiin, laakiin mar
dambe ayaan idin arki doonaa, qalbigiinnuna wuu farxi
doonaa, farxaddiinnana ninna idinkama qaadi doono. 23 Oo
maalintaasna waxba ima weyddiin doontaan. Runtii, runtii,
waxaan idinku leeyahay, Haddii aad wax uun weyddiisataan
Aabbaha, magacayga ayuu idinku siin doonaa. 24 Tan iyo
imminka waxba magacayga kuma weyddiisan. Weyddiista,
waanad heli doontaan, inay farxaddiinnu buuxsanto. 25
Waxyaalahaas ayaan masaallo idinkula hadlay. Waxaa
imanaysa goortii aanan mar dambe masaallo idinkula
hadli doonin, laakiin aan bayaan idiinkaga warrami doono
Aabbaha. 26 Maalintaas waxaad ku weyddiisan doontaan
magacayga. Idinkuma lihi inaan Aabbaha baryayo daraaddiin.
27 Waayo, Aabbaha qudhiisu wuu idin jecel yahay, maxaa
yeelay, waad i jeclaateen, oo waadna rumaysateen inaan
xagga Ilaah ka imid. 28 Aabbaha ayaan ka imid oo dunida
imid. Haddana waan ka tegayaa dunida oo Aabbahaan u
tegayaa. 29 Xertiisii ayaa ku tidhi, Bal eeg, bayaan baad
hadda u hadlaysaaye, oo masaal ku hadli maysid. 30
Imminka waannu garanaynaa inaad wax walba taqaan,
oo aadan u baahnayn qofna inuu wax ku weyddiiyo. Taas
aawadeed waannu rumaysan nahay inaad Ilaah ka timid.
31 Ciise ayaa ugu jawaabay, Hadda ma rumaysan tihiin?
32 Ogaada, saacaddii baa imanaysa, waana timid, kolkaad
u kala firdhi doontaan mid kasta xaggiisa, anna keligay
baad iga tegi doontaan, oo weliba keligay ma ihi, waayo,
waxaa ila jooga Aabbaha. 33 Waxyaalahaas waxaan idiinkula
hadlay inaad nabad igu haysataan. Dunida ayaad dhib
kala kulantaan, laakiinse kalsoonaada, anaa ka adkaaday
dunidaye.

**17** Waxyaalahaas Ciise ayaa ku hadlay, markaasuu
indhihiisii kor u qaaday xagga samada oo yidhi,
Aabbow, saacaddii way timid. Ammaan Wiilkaaga inuu Wiilku
ku ammaano, 2 sidaad amar ugu siisay dadka oo dhan inuu
nolosha weligeed ah siiyo kuwaad isaga siisay oo dhan.
(aiōnios g166) 3 Tanu waa nolosha weligeed ah inay ku gartaan,
adoo ah Ilaaha runta ah oo keliya, iyo inay gartaan Ciise
Masiix, kii aad soo dirtay. (aiōnios g166) 4 Dhulka ayaan kugu
ammaanay, anoo dhammeeyey shuqulkaad ii dhiibtay inaan
sameeyo. 5 Haddana, Aabbow, adiga qudhaadu igu ammaan
ammaantaan kula lahaa intaan dunidu jirin. 6 Magacaagaan
u muujiyey dadkii aad dunida iga siisay. Kuwaagii bay
ahaayeen, oo anaad i siisay, iyaguna ereygaagay xajiyeen.
7 Hadda waxay garanayaan wax kastoo aad i siisayba inay
xaggaaga ka yimaadeen. 8 Waayo, erayadaad i siisay ayaan
siiyey iyaga, wayna aqbaleen, run ahaan bayna u garteen
inaan kaa imid, wayna rumaysteen inaad i soo dirtay. 9 Iyaga
waan kuu baryayaa; kuu baryi maayo dunida, laakiin waxaan
kuu baryayaa kuwaad i siisay, waayo, waa kuwaagii. 10
Waxayga oo dhan adaa leh, waxaagana anaa leh, iyagana
waan ku ammaanmay. 11 Anigu dunida sii joogi maayo;
kuwanuse duniday joogayaan, aniguna waan kuu imanayaa.
Aabbe Quduusow, iyaga ku hay magacaagii aad i siisay,
inay mid ahaadaan sideenna oo kale. 12 Intaan iyaga la jiray,
waxaan iyaga ku hayay magacaagii aad i siisay, waanan
ilaaliyey, midkoodna ma lumin, wiilka halaagga maahee,
in Qorniinku ahaado. 13 Haddana waan kuu imanayaa,
oo waxyaalahan ayaan ku hadlayaa intaan dunida joogo
inay haystaan farxaddayda oo ay ka buuxsanto iyaga. 14
Ereygaagii ayaan siiyey, oo dunidu waa nebcaatay, waayo,
iyagii kuwa dunida ma aha, sidaanan kan dunida u ahayn. 15
Kaa baryi maayo inaad iyaga dunida ka qaaddid, waxaanse
kaa baryayaa inaad ka dhawrtid kan sharka leh. 16 Iyagu
kuwa dunida ma aha, sidaanan kan dunida u ahayn. 17 Iyaga
quduus kaga dhig runta, ereygaagu waa rune. 18 Sidaad
dunida iigu soo dirtay ayaan anna iyaga dunida ugu diray.
19 Oo aawadood ayaan quduus iskaga dhigaa, in iyagana
xagga runta quduus lagaga dhigo. 20 Kuwan oo keliya
kuu baryi maayo, waxaanse weliba kuu baryayaa kuwa igu
rumaysanaya hadalkooda aawadiis, 21 inay dhammaan mid
ahaadaan, sidaad adigu, Aabbow, iigu jirtid, aniguna aan
kuugu jiro, inay iyaguna inoogu jiraan, in dunidu rumaysato
inaad i soo dirtay. 22 Oo ammaantaad i siisay iyagaan siiyey,
inay mid ahaadaan sidaynu mid u nahay. 23 Iyagaan ku jiraa,
adna anigaad igu jirtaa, inay mid ku dhan yihiin, in dunidu
garato inaad i soo dirtay, iyo inaad iyaga u jeclaatay, sidaad
ii jeclaatay. 24 Aabbow, kuwaad i siisay waan doonayaa inay
ila joogaan meeshaan joogo inay arkaan ammaantaydii aad i
siisay, waayo, adaa i jeclaa intaan dunida la aasaasin. 25

Aabbaha xaqa ahow, dunidu kuma ay garanaynin, laakiinse
waan ku garanayay; kuwanna waxay garanayeen inaad
i soo dirtay. 26 Magacaagaan iyagii garansiiyey, waanan
garansiin doonaa, in jacaylkii aad i jeclayd uu ku jiro iyaga,
anna aan iyaga ku jiro.

**18** Ciise markuu waxyaalahaas yidhi wuu la baxay xertiisii
oo kala gudbay Tog Qidroon, meeshay ku tiil beer uu
galay, isaga iyo xertiisiiba. 2 Yuudasna, kii gacangeliyey,
meeshaas wuu garanayay, waayo, Ciise marar badan
ayuu meeshaas xertiisii la tegi jiray. 3 Haddaba Yuudas
isagoo askar iyo saraakiil ka wada wadaaddadii sare iyo
Farrisiintii ayuu meeshaas la yimid laambado iyo siraaddo
iyo hub. 4 Sidaa daraaddeed Ciise isagoo og waxa ku dhici
doona oo dhan ayuu baxay oo ku yidhi iyaga, Kumaad
doondoonaysaan? 5 Waxay ugu jawaabeen, Ciisihii reer
Naasared. Markaasaa Ciise wuxuu ku yidhi, Isagii baan ahay.
Waxaana iyaga la taagnaa Yuudas kii gacangeliyey. 6 Sidaa
daraaddeed Ciise markuu ku yidhi, Isagii baan ahay, dib bay
u socdeen, oo dhulkay ku dhaceen. 7 Mar kale haddaba
ayuu weyddiiyey, oo ku yidhi, Kumaad doondoonaysaan?
Oo waxay ku yidhaahdeen, Ciisihii reer Naasared. 8 Ciise
ayaa ugu jawaabay, Waan idiin sheegay inaan isagii ahay.
Haddaba haddaad i doonaysaan, kuwan iska daaya, ha
tageene. 9 Wuxuu saas u yidhi inuu dhammaado hadalkii uu
ku hadlay oo ahaa, Kuwii aad i siisay, midkoodna ma lumin.
10 Simoon Butros haddaba, isagoo seef haysta, ayuu soo
bixiyey, oo wuxuu ku dhuftay wadaadka sare addoonkiisii,
oo ka gooyay dhegta midigta. Addoonkii magiciisu wuxuu
ahaa Malkos. 11 Sidaa daraaddeed Ciise wuxuu Butros
ku yidhi, Seefta galkeeda ku celi. Koobka Aabbuhu i
siiyey miyaanan cabbayn? 12 Haddaba askartii iyo ninkii
u sarreeyey iyo saraakiishii Yuhuudda ayaa Ciise qabtay,
markaasay xidhxidheen, 13 oo markii hore waxay u geeyeen
Annas, waayo, wuxuu ahaa soddoggii Kayafas oo ahaa
wadaadkii sare sannaddaas. 14 Kayafas wuxuu ahaa kii kula
taliyey Yuhuudda inay u roon tahay in nin keliyahu dadka
u dhinto. 15 Waxaa Ciise daba socday Simoon Butros iyo
mid kale oo xer ah. Ninkaas xerta ahaa wadaadka sare
waa garanayay, wuuna la galay Ciise barxadda wadaadkii
sare. 16 Butros se wuxuu taagnaa albaabka agtiisa oo
dibadda ah. Sidaa daraaddeed kii kale oo xerta ahaa oo
wadaadka sare garanayay ayaa dibadda u soo baxay oo
la hadlay tii albaabka ilaalinaysay, oo Butros ayuu soo
geliyey. 17 Gabadhii albaabka ilaalinaysay waxay Butros
ku tidhi, Adiguna ma waxaad tahay mid ka mid ah ninkan
xertiisa? Wuxuu ku yidhi, Ma ihi. 18 Markaasaa waxaa
taagnaayeen addoommadii iyo saraakiishii oo dab dhuxul
ah sameeyey, maxaa yeelay, dhaxan bay ahayd, wayna
kulaalayeen. Butrosna wuu la joogay, isagoo taagan oo
dabka kulaalaya. 19 Haddaba wadaadkii sare wuxuu Ciise
wax ka weyddiiyey xertiisii iyo waxbariddiisii. 20 Ciise ayaa
ugu jawaabay, Bayaan baan dunida ula hadlay, oo weligay
wax baan ku bari jiray sunagogyada iyo macbudka, meesha
ay Yuhuudda oo dhammi isugu timaado, oo waxba si qarsoon
uma odhan jirin. 21 Maxaad ii weyddiinaysaa? Weyddii kuwa
maqlay waxaan kula hadlay. Bal eeg, kuwaasaa og waxaan
idhi e. 22 Markuu sidaas yidhi saraakiishii midkood oo ag
taagnaa ayaa Ciise dharbaaxay isagoo leh, Ma saasaad ugu
jawaabaysaa wadaadka sare? 23 Ciise ayaa ugu jawaabay,
Haddii aan si xun u hadlay, xumaanta ka marag fur, haddaan
si wanaagsan u hadlayse, maxaad ii dharbaaxaysaa? 24
Annas haddaba wuxuu isagoo xidhxidhan u diray Kayafas
oo ahaa wadaadka sare. 25 Simoon Butros ayaa taagnaa
oo dabka kulaalayay. Haddaba waxay ku yidhaahdeen,
Adiguna ma waxaad tahay xertiisii midkood? Markaasuu
inkiray oo yidhi, Ma ihi. 26 Addoommadii wadaadka sare
midkood oo qaraabo ay ahaayeen kii Butros uu dhegta ka
gooyay wuxuu yidhi, Miyaanan beerta kugula arkin isaga?
27 Haddaba Butros mar kale ayuu inkiray, oo markiiba diiqii
baa ciyey. 28 Haddaba Ciise ayay ka kaxeeyeen Kayafas
ilaa guriga taliyaha. Waxay ahayd aroortii hore, oo iyagu ma
ay gelin guriga taliyaha si aanay u nijaasoobin, laakiinse
inay cashadii Iidda Kormaridda wax ka cunaan. 29 Bilaatos
haddaba ayaa u soo baxay iyagii oo ku yidhi, Maxaad
ku ashtakaynaysaan ninkan? 30 Way u jawaabeen oo ku
yidhaahdeen, Ninkanu haddaanu ahayn xumaanfale, kuuma
aannu soo gacangelinneen. 31 Haddaba Bilaatos wuxuu ku
yidhi, Idinku qaata, oo sharcigiinna ku xukuma. Yuhuuddu
waxay ku yidhaahdeen, Xalaal nooma aha inaannu nin dillo,
32 inuu ahaado hadalkii Ciise ku hadlay kolkuu sheegay
siduu u dhiman doono. 33 Bilaatos haddaba guriga taliyaha
ayuu mar kale galay oo Ciise u yeedhay, oo wuxuu ku yidhi,
Adigu ma waxaad tahay Boqorka Yuhuudda? 34 Ciise ayaa
ugu jawaabay, Ma adaa iska odhanaya waxaas, mise kuwa
kalaa iiga kaa sheegay? 35 Bilaatos ayaa ugu jawaabay, Ma
Yuhuudi baan ahay? Quruuntaadii iyo wadaaddadii sare
ayaa ii soo kaa gacangeliyeye. Maxaad samaysay? 36 Ciise
ayaa ugu jawaabay, Boqortooyadaydu tan dunidan ma aha.
Haddii boqortooyadaydu tan dunidan tahay, midiidinyadaydu
waa ii diriri lahaayeen inaan Yuhuudda la ii gacangelin.
Imminkase boqortooyadaydu tan halkan ma aha. 37 Sidaa
daraaddeed Bilaatos ayaa ku yidhi, Haddaba ma boqor
baad tahay? Ciise ayaa ugu jawaabay, Waad tidhaahdaa

inaan boqor ahay. Taas ayaan u dhashay, oo taas ayaan
dunida u imid, inaan marag u furo runta. Mid kasta oo kan
runta ah wuu maqlaa codkayga. 38 Bilaatos ayaa ku yidhi,
Waa maxay runtu? Oo markuu sidaa ku yidhi, mar kale
ayuu Yuhuudda u baxay oo ku yidhi, Eedna isagii kuma
aan helin. 39 Laakiin waxaad leedihiin caado inaan mid
idiin sii daayo Iidda Kormaridda. Haddaba ma doonaysaan
inaan idiin sii daayo Boqorkii Yuhuudda? 40 Kolkaasay
dhammaan mar kale qayliyeen iyagoo leh, Ninkan ma aha,
laakiin Baraabbas. Baraabbas wuxuu ahaa waxdhace.

**19** Markaasaa Bilaatos haddaba Ciise watay oo
karbaashay, 2 askartiina taaj ayay qodxan uga taxeen,
oo madaxiisay saareen, oo waxay u geliyeen dhar guduudan.
3 Markaasay u yimaadeen oo ku yidhaahdeen, Nabad
Boqorka Yuhuuddow, wayna dharbaaxeen. 4 Bilaatos
haddana dibadduu u baxay oo ku yidhi iyaga, Eega, isagaan
idiin soo bixinayaa inaad ogaataan inaanan eed ku helin. 5
Ciise haddaba ayaa dibadda u soo baxay isagoo sita taajkii
qodxanta ahaa iyo dharkii guduudnaa, oo Bilaatos ayaa ku
yidhi iyaga, Bal eega ninka. 6 Sidaa daraaddeed markii
wadaaddadii sare iyo saraakiishii arkeen, ayay qayliyeen
iyagoo leh, Iskutallaabta ku qodob, iskutallaabta ku qodob.
Bilaatos ayaa ku yidhi, Idinku wata, oo iskutallaabta ku
qodba, waayo, anigu eed kuma aan heline. 7 Yuhuuddii
ayaa ugu jawaabtay, Sharci baannu leennahay, sharcigaas
xaggiisana waa inuu dhinto, waayo, wuxuu iska dhigay Wiilka
Ilaah. 8 Haddaba Bilaatos markuu hadalkaas maqlay, aad
buu u sii baqay, 9 oo haddana wuxuu galay guriga taliyaha
oo ku yidhi Ciise, Xaggee baad ka timid? Laakiin Ciise
jawaabna uma uu celinin. 10 Sidaa daraaddeed Bilaatos
ayaa ku yidhi, Miyaanad ila hadlayn? Miyaanad ogayn
inaan leeyahay amar aan kugu sii daayo iyo amar aan
iskutallaabta kugu qodbo? 11 Ciise ayaa ugu jawaabay,
Amarna iguma aad lahaateen haddaan xagga sare lagaa
siin. Sidaa daraaddeed kii ii soo kaa gacangeliyey ayaa kaa
dembi weyn. 12 Taas dabadeed Bilaatos wuxuu doonayay
inuu sii daayo, laakiin Yuhuuddii ayaa qaylisay iyagoo leh,
Haddaad ninkan sii daysid, Kaysar saaxiibkiis ma ihid. Nin
kasta oo boqor iska dhigaba, wuxuu ku caasiyaa Kaysar.
13 Haddaba Bilaatos markuu hadalladaas maqlay, ayuu
Ciise dibadda u soo saaray, oo wuxuu ku fadhiistay kursiga
xukumaadda, meesha la yidhaahdo Sallaxa Dhagaxa ah oo
af Cibraanigana lagu yidhaahdo Gabbata. 14 Haddaba waxay
ahayd Maalintii Diyaargarayskii Kormaridda, abbaaraha
saacaddii lixaad. Oo wuxuu Yuhuudda ku yidhi, Bal eega
boqorkiinna. 15 Sidaa daraaddeed waxay ku qayliyeen,
Kaxee, kaxee, iskutallaabta ku qodob. Markaasaa Bilaatos
wuxuu ku yidhi, Boqorkiinna miyaan iskutallaabta ku qodbaa?
Wadaaddadii sare ayaa ugu jawaabay, Boqor ma lihin Kaysar
maahee. 16 Markaasuu haddaba u dhiibay in iskutallaabta
lagu qodbo. 17 Wayna kaxeeyeen Ciise. Markaas isagoo sita
iskutallaabta ayuu u kacay meeshii Dhakada la yidhaahdo,
oo af Cibraaniga lagu odhan jiray Golgota, 18 meeshaasay
iskutallaabaha ku qodbeen isaga iyo laba kale, midba
gees, Ciisena dhexda. 19 Bilaatosna wax buu qoray oo
ku dhejiyey iskutallaabta dusheeda, waxaana ku qorraa,
CIISIHII REER NAASARED, BOQORKA YUHUUDDA. 20
Haddaba Yuhuudda badideed ayaa qorniinkaas akhriday,
waayo, meeshii Ciise iskutallaabta lagaga qodbay waa
u dhowayd magaalada, oo qorniinkii wuxuu ku qorraa af
Cibraaniga iyo af Roomaaniga iyo af Gariigga. 21 Sidaa
daraaddeed wadaaddadii sare oo Yuhuudda waxay Bilaatos
ku yidhaahdeen, Ha qorin, Boqorka Yuhuudda, laakiin qor,
Kanaa yidhi, Waxaan ahay Boqorka Yuhuudda. 22 Bilaatos
ayaa ugu jawaabay, Waxaan qoray ayaan qoray. 23 Haddaba
askartii markay Ciise iskutallaabta ku qodbeen, dharkiisay
qaateen oo ay afar meelood ka dhigeen, askari waliba
meel buu qaatay, khamiiskiina way qaateen. Khamiiskii
meella kama tollayn dusha iyo hoosta. 24 Sidaa daraaddeed
waxay isku yidhaahdeen, Yeynan kala jeexin, laakiin aan
u saami ridanno kii heli doona, inuu noqdo Qorniinka oo
leh, Iyagu waxay qaybsadeen dharkaygii. Khamiiskaygiina
way u saami riteen. Haddaba waxyaalahaas askartii baa
samaysay. 25 Waxaa Ciise iskutallaabtiisa ag taagnaa
hooyadiis, iyo habaryartiis, Maryan afadii Kaloobaas, iyo
Maryan tii reer Magdala. 26 Sidaa daraaddeed Ciise markuu
arkay hooyadiis iyo kii xerta ahaa oo uu jeclaa oo ag taagan,
ayuu hooyadiis ku yidhi, Islaan yahay, waa kaa wiilkaagii. 27
Markaasuu kii xerta ahaana ku yidhi, Waa taa hooyadaa.
Oo saacaddaas dabadeed kii xerta ahaa ayaa gurigiisii u
kaxeeyey. 28 Markaas dabadeed Ciise isagoo garanaya
wax kasta inay dhammaadeen, in Qorniinku ahaado, ayuu
yidhi, Waan harraadsanahay. 29 Markaas waxaa meeshaas
yiil weel khal ka buuxo. Sidaa daraaddeed geed isbonji
la yidhaahdo bay khalkii ka buuxiyeen, markaasay kor
saareen geed husob la yidhaahdo oo afkiisa ku dhoweeyeen.
30 Haddaba markii Ciise khalkii qaatay ayuu yidhi, Waa
dhammaatay, markaasuu madaxa foororshay oo ruuxii
bixiyey. 31 Sidaa daraaddeed Yuhuuddii, inaan meydadku
sabtida iskutallaabaha sii saarnaan, waxay Bilaatos ka
baryeen in lugaha laga jebiyo oo meydadka la qaado,
waayo, waxay ahayd Maalintii Diyaargarayska, oo maalinta
sabtidaas waxay ahayd maalin weyn. 32 Haddaba askartii

waa timid, oo ay lugaha ka jebiyeen kii hore iyo kii kale oo
iskutallaabaha lagula qodbay isaga. **33** Laakiin markay Ciise
u yimaadeen oo ay arkeen inuu durba dhintay kama ay
jebin lugihii. **34** Laakiin mid askartii ka mid ah ayaa dhinaca
Ciise waran kaga wareemay, oo markiiba waxaa ka soo
baxay dhiig iyo biyo. **35** Oo kii arkayna wuu marag furay,
maraggiisuna waa run, wuuna garanayaa inuu run sheegayo,
inaad idinkuna rumaysataan. **36** Waayo, waxyaalahaas
waxay u dhaceen inuu ahaado Qorniinka leh, Lafihiisa
midna la jebin maayo. **37** Oo Qorniin kale wuxuu leeyahay,
Way arki doonaan kii ay wareemeen. **38** Waxyaalahaas
dabadeed, Yuusuf kii ahaa reer Arimataya, isagoo xer u ah
Ciise laakiinse si qarsoon cabsidii uu ka cabsaday Yuhuudda
aawadeed, wuxuu Bilaatos ka baryay inuu meydka Ciise
qaado. Bilaatosna waa u fasaxay. Sidaa daraaddeed wuu
yimid oo meydkiisii qaaday. **39** Oo waxaa kaloo yimid
Nikodemos kii markii hore habeennimada u yimid, wuxuuna
keenay malmal iyo cuud isku qasan oo qiyaastii boqol
rodol ah. **40** Haddaba waxay qaadeen meydkii Ciise oo
ku duudduubeen maryo iyo dhir udgoon siday caadada
aasniinta Yuhuuddu ahayd. **41** Meeshii isaga iskutallaabta
lagu qodbay waxaa ku tiil beer, beerta dhexdeedana waxaa
ku tiil xabaal cusub oo aan ninna weli la dhigin. **42** Haddaba
Maalintii Diyaargarayska oo Yuhuudda aawadeed ayay
meeshaas Ciise u dhigeen, waayo, xabaashii waa dhowayd.

**20** Maalintii ugu horraysay ee toddobaadka Maryan tii
reer Magdala ayaa aroortii hore xabaashii timid, intay
weli gudcur ahayd, oo waxay aragtay dhagaxii oo xabaashii
laga qaaday. **2** Sidaa daraaddeed way orodday oo u tagtay
Simoon Butros iyo kii kale oo xerta ahaa oo Ciise jeclaa,
waxayna ku tidhi, Sayidkii ayay xabaashii kala baxeen,
oo garan mayno meeshay dhigeen. **3** Saas aawadeed
Butros iyo kii kale oo xerta ahaa ayaa baxay, oo waxay
tageen xabaashii. **4** Way wada ordeen labadoodiiba, oo
kii kale oo xerta ahaa ayaa Butros ka dheereeyey, oo uga
hor maray xabaashii. **5** Markaasuu foororsaday, oo wuxuu
arkay maryihii oo yaal, laakiinse ma uu gelin. **6** Haddana
Simoon Butros oo daba socday baa yimid, markaasuu
xabaashii galay, oo wuxuu arkay maryihii oo yaal **7** iyo
maradii madaxiisa saarnayd oo aan la oollin maryihii, laakiin
meel keligeed ku duudduubnayd. **8** Markaas haddaba waxaa
galay kii kale oo xerta ahaa oo hore u yimid xabaashii,
wuuna arkay oo rumaystay. **9** Waayo, weli Qorniinka ma
ay garan inay tahay inuu kuwa dhintay ka soo sara kaco.
**10** Haddaba xertii ayaa mar kale guryahoodii ku noqotay.
**11** Laakiin Maryan ayaa xabaashii dibaddeeda taagnayd
iyadoo ooyaysa. Haddaba intay ooyaysay bay xabaashii ku
foororsatay. **12** Waxayna aragtay laba malaa'igood oo dhar
cadcad xidhan oo fadhiya meesha meydka Ciise oolli jiray,
mid madaxa, midna cagaha. **13** Oo waxay ku yidhaahdeen,
Haweenay yahay, maxaad u ooyaysaa? Markaasay ku tidhi,
Waxaan u ooyayaa, Sayidkaygii bay qaadeen, oo garanna
maayo meeshay dhigeen. **14** Markay sidaa ku tidhi ayay
dib u jeesatay oo ay aragtay Ciise oo taagan, mana ay
garanaynin inuu Ciise yahay. **15** Markaasaa Ciise wuxuu
ku yidhi, Haweenay yahay, Maxaad u ooyaysaa? Kumaad
doondoonaysaa? Iyadoo u malaynaysa inuu yahay ninkii
beerta ka shaqaynayay waxay ku tidhi, Adeerow, haddaad
isagii halkan ka qaadday, ii sheeg meeshaad dhigtay, anna
waan ka soo qaadan doonaaye. **16** Ciise wuxuu ku yidhi,
Maryamay. Markaasay jeesatay oo afka Cibraaniga ku tidhi,
Rabbooni, ee ah Macallimow. **17** Ciise ayaa ku yidhi, Ha i
taaban, waayo, weli kor uguma aan tegin Aabbaha, laakiin
u tag walaalahay oo ku dheh, Wuxuu yidhi, Waxaan kor
ugu tegayaa Aabbahay oo ah Aabbihiin, Ilaahay oo ah
Ilaahiin. **18** Maryan tii reer Magdala ayaa timid oo xertii ku
tidhi, Waxaan arkay Sayidkii, oo waxay u sheegtay inuu
waxyaalahaas iyada ku yidhi. **19** Haddaba maalintaas markay
makhribkii ahayd, ayaantii u horraysay ee toddobaadka, oo
ay albaabbadu xidhnaayeen meeshay xertu joogtay cabsida
ay Yuhuudda ka cabsadeen aawadeed, ayaa Ciise yimid oo
isdhex taagay, oo wuxuu ku yidhi, Nabadi ha idinla jirto. **20**
Oo markuu waxaas yidhi, wuxuu iyagii tusay gacmihiisii iyo
dhinaciisii. Sidaa daraaddeed xertii waa ku farxeen markay
Sayidkii arkeen. **21** Haddaba Ciise ayaa mar kale ku yidhi,
Nabadi ha idinla jirto. Sida Aabbuhu ii soo diray ayaan
anna idiin dirayaa. **22** Oo markuu waxaas yidhi ayuu ku
neefsaday oo ku yidhi, Aqbala Ruuxa Quduuskaa. **23** Nin
alla ninkaad dembiyadiisa cafidaan way cafiyan yihiin, nin
alla ninkaad dembiyadiisa ku celisaan way ceshan yihiin.
**24** Laakiin Toomas mid laba iyo tobanka ka mid ah oo
Didumos la odhan jiray lama joogin markuu Ciise yimid.
**25** Haddaba xertii kale ayaa ku tidhi, Waxaannu aragnay
Sayidkii. Laakiin wuxuu ku yidhi, Haddaanan gacmihiisa
ku arkin calaamadii musmaarrada, oo aanan fartayda
gelin nabarkii musmaarrada, oo aanan gacantayda gelin
dhinaciisa, rumaysanba maayo. **26** Oo siddeed maalmood
dabadeed xertiisii gudaha ayay mar labaad wada joogeen, oo
Toomasna waa la joogay. Markaasaa Ciise yimid, albaabbadii
oo xidhan, oo intuu isdhex taagay ayuu ku yidhi, Nabadi
ha idinla jirto. **27** Markaasuu Toomas ku yidhi, Fartaada
keen oo arag gacmahayga, oo gacantaadana keen oo
geli dhinacayga, oo ha rumaysad la'aanin laakiin rumayso.

28 Toomas ayaa u jawaabay oo ku yidhi, Rabbigay iyo
Ilaahayow. 29 Markaasaa Ciise ku yidhi, Waad i aragtay, taas
aawadeed ayaad rumaysatay. Waxaa barakaysan kuwa aan
i arag ee rumaystay. 30 Haddaba waxaa Ciise ku sameeyey
xertii hortooda calaamooyin kale oo badan oo aan ku qorrayn
kitaabkan. 31 Laakiin waxyaalahan waxaa loo qoray inaad
rumaysataan inuu Ciise yahay Masiixa, Wiilka Ilaah, iyo
inaad nolosha ku lahaataan magiciisa idinkoo rumaysanaya.

**21** Waxyaalahaas dabadeed Ciise ayaa mar kale xertii
isugu muujiyey Bad Tiberiyas agteeda. Oo sidatan
ayuu isu tusay. 2 Waxaa wada joogay Simoon Butros, iyo
Toomas ka la yidhaahda Didumos, iyo Nataana'el oo ahaa
kii Kaana tii Galili, iyo wiilashii Sebedi, iyo laba kale oo
xertiisa ah. 3 Simoon Butros wuxuu iyaga ku yidhi, Waa soo
kalluumaysanayaa. Markaasay ku yidhaahdeen, Annana
waa ku raacaynaa. Markaasay tageen oo doonnida fuuleen;
laakiin habeenkaas waxba ma ay qaban. 4 Laakiin markii
waagu beryay Ciise wuxuu taagnaa xeebta, xertiisiise ma ay
garanaynin inuu Ciise yahay. 5 Markaasaa Ciise haddaba
ku yidhi, Carruur yahay, wax la cuno ma haysaan? Waxay
ugu jawaabeen, Maya. 6 Markaasuu ku yidhi, Shabagga ku
tuura dhinaca midigta ee doonnida, waadna heli doontaane.
Haddaba way tuureen, oo ma ayna karin inay soo jiidaan,
kalluunka faro badnaantiisa aawadeed. 7 Kii xerta ahaa oo
Ciise jeclaa ayaa ku yidhi Butros, Waa Sayidkii. Haddaba
markuu Simoon Butros maqlay inuu Sayidka yahay, ayuu
dharkiisa guntaday (waayo, wuu qaawanaa), oo wuxuu isku
tuuray badda. 8 Laakiin xertii kale waxay ku yimaadeen
sixiimadda yar (waayo, kama ay fogayn dhulka, laakiin
waxay u jireen qiyaastii laba boqol oo dhudhun), waxayna
jiidayeen shabaggii kalluunka. 9 Haddaba markay dhulkii
u soo degeen waxay arkeen dab dhuxul ah iyo kalluun
saaran iyo kibis. 10 Markaasaa Ciise ku yidhi iyagii, Keena
qaar kalluunkaad hadda soo qabateen. 11 Haddaba Simoon
Butros ayaa sixiimaddii fuulay, oo wuxuu xagga dhulka u
jiiday shabaggii oo ka buuxa boqol iyo saddex iyo konton
kalluun oo waaweyn, oo in kastoo ay faro badnaayeen
shabaggii ma dillaacin. 12 Markaasaa Ciise wuxuu iyaga
ku yidhi, Kaalaya oo quraacda. Oo xertii midkoodna kuma
uu dhicin inuu yidhaahdo, Kumaad tahay? waayo, waxay
garanayeen inuu Sayidka yahay. 13 Kolkaasaa Ciise yimid
oo qaaday kibistii oo siiyey iyaga, kalluunkiina sidoo kale. 14
Taasu waa markii saddexaad oo Ciise xertii isu muujiyey
markii uu kuwa dhintay ka soo sara kacay dabadeed.
15 Haddaba markay quraacdeen dabadeed Ciise wuxuu
Simoon Butros ku yidhi, Simoon ina Yoonisow, kuwan ma
iga jeceshahay? Wuxuu ku yidhi, Haah, Sayidow, waad og
tahay inaan ku jeclahay. Markaasuu ku yidhi, Baraarkayga
daaji. 16 Haddana wuxuu mar labaad ku yidhi isaga, Simoon
ina Yoonisow, ma i jeceshahay? Wuxuu ku yidhi, Haah,
Sayidow, waad og tahay inaan ku jeclahay. Markaasuu ku
yidhi, Idahayga ilaali. 17 Markii saddexaad ayuu ku yidhi,
Simoon ina Yoonisow, Ma i jeceshahay? Butros ayaa ka
calool xumaaday, waayo, wuxuu markii saddexaad ku yidhi,
Ma i jeceshahay? Markaasuu ku yidhi, Sayidow, wax walba
waad og tahay, waadna garanaysaa inaan ku jeclahay. Ciise
ayaa ku yidhi, Idahayga daaji. 18 Runtii, runtii, waxaan kugu
leeyahay, Markaad yarayd adigu waad guntan jirtay, oo
waxaad mari jirtay meeshaad doonaysay, laakiin markaad
gabowdid, gacmahaad kala bixin doontaa, oo mid kalaa
kuu guntin doona, oo wuxuu kuu qaadi doonaa meel aadan
doonayn. 19 Wuxuu waxaas u yidhi inuu tuso dhimashaduu
Ilaah ku ammaani doono. Markuu waxaas yidhi dabadeed,
wuxuu ku yidhi, I soo raac. 20 Butros markuu jeestay
wuxuu arkay kii xerta ahaa oo Ciise jeclaa oo daba socda;
isagu wuxuu ahaa kii laabta Ciise ku tiirsanaa wakhtigii
cashada oo ku yidhi, Sayidow, waa kuma kan ku gacangelin
doonaa? 21 Haddaba Butros markuu arkay, wuxuu Ciise ku
yidhi, Sayidow, kanna ka warran? 22 Ciise wuxuu ku yidhi,
Haddaan doonayo inuu joogo ilaa aan imanayo, maxaa kaa
galay? Adigu i soo raac. 23 Haddaba waxaa walaalaha ku
dhex faafay hadalkaas oo leh, Kaas oo xerta ka mid ahaa
ma dhiman doono. Laakiin Ciise kuma odhan, Ma dhiman
doono, wuxuuse yidhi, Haddaan doonayo inuu joogo ilaa
aan imanayo, maxaa kaa galay? 24 Kan weeye kii xerta
ahaa oo u marag furay waxyaalahan, oo qoray waxyaalahan,
oo waxaannu garanayna maraggiisu inuu run yahay. 25
Waxaana jira waxyaalo badan oo kale oo Ciise sameeyey,
oo haddii mid mid loo wada qoro, waxaan u malaynayaa
inaan dunidu qaaddeen buugagga laga qoro.

# Falimaha Rasuullada

**1** Te'ofilosow, hadalkii hore waxaan ka qoray wax kasta
oo Ciise bilaabay inuu sameeyo oo baro **2** ilaa maalintii
sare loo qaaday isaga oo ka dambaysay wakhtiguu Ruuxa
Quduuskaa ku amray rasuulladii uu doortay. **3** Markuu
xanuunsaday dabadeed, iyagii ayuu isagoo nool waxyaalo
badan oo la hubo isugu muujiyey, oo muddo afartan
maalmood ah ayuu iyagii u muuqday, oo kala hadlay
waxyaalaha ku saabsan boqortooyada Ilaah. **4** Oo intuu
iyagii la shiray, ayuu wuxuu kula dardaarmay, oo ku
yidhi, Yeruusaalem ha ka tegina, laakiinse suga ballankii
Aabbaha oo aad iga maqasheen, **5** waayo, runtii Yooxanaa
wuxuu dadka ku baabtiisay biyo, laakiinse waxaa laydinku
baabtiisi doonaa Ruuxa Quduuska ah maalmo aan badnayn
dabadood. **6** Sidaas daraaddeed markay isu yimaadeen,
ayay weyddiiyeen isaga oo waxay ku yidhaahdeen, Rabbow,
ma haddeer baad boqortooyada u soo celinaysaa Israa'iil? **7**
Markaasuu iyaga ku yidhi, Dantiinna ma aha inaad ogaataan
wakhtiyada iyo xilliyada uu Aabbuhu amarkiisa kaga dhigay.
**8** Laakiinse waxaad heli doontaan xoog markii Ruuxa
Quduuska ahi idinku soo dego; oo markhaatiyaal ayaad
iiga noqon doontaan Yeruusaalem, iyo Yahuudiya oo dhan,
iyo Samaariya, iyo meesha dunida ugu fog. **9** Oo kolkuu
waxyaalahaas yidhi dabadeed, iyagoo eegaya, ayaa sare
loo qaaday isagii, oo daruur baa indhahoodii ka qarisay. **10**
Oo intuu sii socday, iyagoo samada aad u fiirinaya, ayaa
waxaa isa soo ag taagay laba nin oo dhar cadcad qaba,
**11** oo waxay ku yidhaahdeen, Nimankiinan reer Galiliyow,
maxaad la taagan tihiin oo aad samada u eegaysaan?
Ciisahan samada laydiinka sare qaaday, sidaad u aragteen
isagoo samada u socda oo kale ayuu u iman doonaa. **12**
Markaasay Yeruusaalem ku noqdeen iyagoo ka yimid buurtii
Saytuun la odhan jiray, oo u dhowayd Yeruusaalem, oo u
jirtay maalin sabtiyeed socodkeed. **13** Oo markay magaaladii
galeen, waxay aadeen qolladdii sare, meeshay joogi jireen
Butros iyo Yooxanaa iyo Yacquub iyo Andaros, iyo Filibos
iyo Toomas, iyo Bartolomayos, iyo Matayos, iyo Yacquub ina
Alfayos, iyo Simoon Qiiroleh, iyo Yuudas ina Yacquub. **14**
Kuwaas oo dhammu, iyagoo isku wada qalbi ah, ayay ku
sii adkaysteen tukasho, iyaga iyo dumarka, iyo Maryan oo
ahayd Ciise hooyadiis, iyo walaalihiis. **15** Oo wakhtigaas
ayaa Butros walaalaha dhexdooda istaagay (oo waxaa wada
jiray dad badan oo qiyaastoodu ahayd boqol iyo labaatan);
markaasuu yidhi, **16** Walaalayaalow, waxaa waajib ahaa
in Qorniinku noqdo, kaas oo Ruuxa Quduuska ahu waagii
hore afka Daa'uud kaga hadlay waxa ku saabsan Yuudas oo
ahaa kii waday kuwii qabtay Ciise. **17** Maxaa yeelay, isaga
waa laynagu tirshay, oo shuqulkan ayuu qaybtiisii helay.
**18** Haddaba ninkaasu meel ayuu ku iibsaday abaalgudka
xaqdarradiis; oo intuu madax madax u dhacay ayuu dhexda
ka kala dillaacay, oo mindhicirkiisii oo dhammuna waa ka soo
daatay. **19** Kolkaasaa kuwii Yeruusaalem joogay oo dhammu
ay wada ogaadeen; sidaas daraaddeed meeshaas waxaa
afkooda loogu bixiyey Akeldama, taas oo micneheedu yahay,
meeshii dhiigga. **20** Waayo, waxaa kitaabkii Sabuurrada lagu
qoray, Gurigiisu cidla' ha noqdo, Ninnana yuusan meeshaas
degin; iyo Wakiilnimadiisa mid kale ha qabto. **21** Haddaba
nimankii inala socday wakhti kasta intuu Rabbi Ciise ina
soo dhex galay, inagana dhex baxay, **22** oo ka bilaabmay
baabtiiskii Yooxanaa ilaa maalintii sare laynooga qaaday
isaga, iyagii midkood waa inuu markhaati ina gala ahaado
sarakiciddiisa. **23** Markaasay laba iska soo saareen, kuwaas
oo ahaa Yuusuf oo la odhan jiray Barsabaas ee naanaystiisu
ahayd Yuustos, iyo Matiyas. **24** Kolkaasay tukadeen oo
yidhaahdeen, Rabbow, adigoo garanaya qalbiga dadka oo
dhan, na tus labadan kaad dooratay, **25** inuu galo meeshii
shuqulkan iyo rasuulnimadan oo Yuudas ka dhacay inuu
meeshiisa tago. **26** Markaasay u saami riteen; saamigiina
wuxuu ku dhacay Matiyas; oo isagana waxaa lagu daray
koob-iyo-tobankii rasuul.

**2** Oo kolkii maalintii Bentekoste la gaadhay, meel bay
kulligood wada joogeen. **2** Oo waxaa filanla'aan samada
ka yimid sanqadh sida dabayl xoog leh oo aad u dhacaysa, oo
waxay buuxisay gurigii ay fadhiyeen oo dhan. **3** Markaasaa
carrabbo u kala qaybsamaya sida dab oo kale iyaga u
muuqday oo ku dul fadhiistay midkood kasta. **4** Kolkaasaa
waxaa kulligood ka wada buuxsamay Ruuxa Quduuska ah,
oo waxay bilaabeen inay afaf kale ku hadlaan sidii Ruuxu
iyaga u siiyey hadalka. **5** Markaas waxaa Yeruusaalem
joogay Yuhuud oo ahaayeen niman cibaado leh oo ka
yimid quruun kasta oo samada hoosteeda joogta. **6** Oo
markii sanqadhaas la maqlay, dadkii badnaa ayaa isu yimid,
wayna yaabeen, maxaa yeelay, nin kastaa wuxuu maqlay
iyagoo afkiisa ku hadlaya. **7** Oo dhammaantood way wada
nexeen oo yaabeen, oo waxay yidhaahdeen, Bal eeg, kuwan
hadlaya oo dhammu miyaanay reer Galili ahayn? **8** Sidee
baa midkeen waluba u maqlaa iyagoo ku hadlaya afkeenna
aynu ku dhalannay? **9** Innagoo ah reer Bartiya iyo Mediya iyo
Ceelaam, iyo kuwa deggan Mesobotamiya, iyo Yahuudiya
iyo Kabbadokiya, iyo Bontos iyo Aasiya, **10** iyo Farugiya iyo
Bamfuliya, iyo Masar iyo meelaha Liibiya oo Kuranaya ku
wareegsan, iyo ajanabiyo Rooma ka yimid oo ah Yuhuud iyo

kuwa raacsan labadaba, 11 iyo reer Kereetee iyo Carabta,
waxaynu maqlaynaa iyagoo ku hadlaya afafkeenna oo ka
hadlaya Ilaah waxyaalihiisa waaweyn. 12 Markaasay wada
yaabeen oo shakiyeen, oo waxay isku yidhaahdeen, Tani
micneheedu waa maxay? 13 Qaar kalena waa ku qosleen oo
waxay yidhaahdeen, Kuwan waxaa ka buuxa khamri cusub.
14 Laakiin Butros intuu koob-iyo-tobankii isla taagay, ayuu
sare u qaaday codkiisa oo ku yidhi iyaga, Niman yahow reer
Yahuudiya iyo dhammaantiinan Yeruusaalem degganow, tan
ogaada oo hadalladayda dhegaysta. 15 Waayo, kuwanu ma
sakhraansana sidaad u malaynaysaan inay sakhraansan
yihiin; maxaa yeelay, tanu waa saacaddii saddexaad ee
maalmeed. 16 Laakiin waxanu waa wixii lagaga dhex hadlay
nebi Yoo'eel, 17 Ilaah baa yidhi, Maalmaha ugu dambaysta
waxyaalahanu waa noqon doonaan, Ruuxayga ayaan ku
shubi doonaa dad oo dhan; Oo wiilashiinna iyo hablihiinnu
wax bay sii sheegi doonaan, Raggiinna dhallinyarada ahuna
wax bay arki doonaan, Odayaashiinnuna riyooyin bay ku
riyoon doonaan; 18 Haah, oo maalmahaas addoommadayda,
rag iyo dumarba, Ruuxaygaan ku shubi doonaa, iyaguna
wax bay sii sheegi doonaan. 19 Oo waxaan samada sare
ka muujin doonaa yaabab, Dhulka hoosena waxaan ka
muujin doonaa calaamooyin, Kuwaas oo ah dhiig iyo dab
iyo uumiskii qiiqa. 20 Qorraxdu waxay u beddelmi doontaa
gudcur, Dayaxuna wuxuu u beddelmi doonaa dhiig, Intaanay
iman maalinta Rabbigu, Taas oo ah maalin weyn oo caan
ah. 21 Oo waxay noqon doontaa in ku alla kii magaca
Rabbiga ku dhawaaqaa, uu badbaadi doono. 22 Rag yahow
reer binu Israa'iil, hadalladan maqla; Ciisihii reer Naasared
oo ahaa nin Ilaah idiinku caddeeyey shuqullo xoog leh
iyo yaabab iyo calaamooyin oo Ilaah ku sameeyey isaga
gacantiisa idinka dhexdiinna, sidaad idinka qudhiinnuba u
og tihiin, 23 markii isaga lagu gacangeliyey taladii Ilaah
goostay oo uu hore u ogaa, gacanta sharcilaawayaasha
ayaad ku qabateen, waadna ku qodobteen iskutallaabta oo
disheen. 24 Isaga Ilaah baa sara kiciyey, oo ka furfuray
xanuunkii dhimashada, maxaa yeelay, dhimashadu ma
xajin karin. 25 Waayo, Daa'uud baa isaga ka hadlay, oo
yidhi, Had iyo jeerba Rabbigaan hortayda ku arki jiray,
Maxaa yeelay, midigtayduu joogaa si aan la ii dhaqaajin.
26 Taas aawadeed qalbigaygu waa farxay, carrabkayguna
waa reyreeyey; Weliba jidhkaygu rajuu ku nasan doonaa.
27 Maxaa yeelay, naftayda Haadees kuma dayn doontid,
Kaaga Quduuska ahna uma dayn doontid inuu qudhun arko.
(Hadēs g86) 28 Waxaad i tustay jidadka nolosha, Hortaadana
farxad baad iga buuxin doontaa. 29 Walaalayaalow, waxaan
si bayaan ah idiinku sheegi karaa in awowe Daa'uud dhintay,
lana aasay, xabaashiisuna ilaa maanta waa inagu dhex
taal. 30 Haddaba isagoo nebi ahaa oo ogaa in Ilaah dhaar
ugu dhaartay isaga inuu dhashiisa midkood carshigiisa ku
fadhiisin doono, 31 wuxuu hore u arkay oo ka hadlay Masiixa
sarakiciddiisa inaan isaga Haadees lagu dayn, jidhkiisuna
qudhun arag. (Hadēs g86) 32 Ciisahan Ilaah baa sara kiciyey,
annagoo dhammuna markhaatiyaal baan ka wada nahay.
33 Haddaba isagoo Ilaah midigtiisa sare loogu qaaday, oo
Aabbaha ka helay ballankii Ruuxa Quduuska ahaa, ayuu
soo shubay waxan oo aad arkaysaan oo maqlaysaan.
34 Maxaa yeelay, Daa'uud samooyinka kor uma aadin;
laakiin isaga qudhiisaa leh, Rabbigu wuxuu Sayidkayga ku
yidhi, Midigtayda fadhiiso 35 Ilaa aan cadaawayaashaada
cagahaaga hoostooda geliyo. 36 Reer binu Israa'iil oo
dhammu aad ha u ogaadeen in Ilaah ka dhigay Rabbi iyo
Masiixba Ciisahan aad iskutallaabta ku qodobteen. 37 Markay
taas maqleen ayaa qalbiga laga wareemay, markaasay ku
yidhaahdeen Butros iyo rasuulladii kale, Walaalayaalow,
maxaannu falnaa? 38 Markaasaa Butros iyagii ku yidhi,
Toobadkeena, oo midkiin kasta ha lagu baabtiiso magaca
Ciise Masiix dembidhaafkiinna aawadiis, oo waxaad heli
doontaan hadiyadda ah Ruuxa Quduuska ah. 39 Maxaa
yeelay, ballanka waxaa leh idinka iyo carruurtiinna iyo kuwa
fog oo dhan in alla intii Rabbiga Ilaaheenna ahu u yeedho.
40 Hadallo kaloo badan ayuu markhaati ahaan ugu waaniyey
isagoo leh, Naftiinna ka badbaadiya qarnigan qalloocan.
41 Markaasaa kuwii hadalkiisii aqbalay la baabtiisay, oo
waxaa maalintaas lagu daray iyaga abbaaraha saddex kun
oo qof. 42 Oo waxay ku sii adkaysteen rasuulladu waxay
bari jireen iyo xidhiidhka ka dhexeeyey iyaga, iyo kibista
jebinteeda iyo tukasho. 43 Oo naf kasta cabsi baa gashay;
oo rasuulladii waxay sameeyeen yaabab iyo calaamooyin
badan. 44 Oo kuwii rumaystay oo dhammu waa wada
jireen, wax walubana waa ka wada dhexeeyeen; 45 oo intay
iibiyeen waxyaalahoodii iyo alaabtoodiiba ayay dhammaan
u wada qaybiyeen sidii nin kasta baahidiisu ahayd. 46 Oo
maalin walba iyagoo isku wada qalbi ah ayay macbudka
ku jiri jireen, oo kibistana guryahooday ku jejebin jireen,
cuntadoodana farxad iyo qalbi daacad ah ayay ku cuni
jireen. 47 Ilaah bay ammaani jireen, oo dadka oo dhammuna
waa u bogay iyaga. Ilaahna maalin walba kuwa badbaadaya
ayuu ku dari jiray.

3 Haddaba saacaddii sagaalaad oo wakhtigii salaadda ah
ayaa Butros iyo Yooxanaa macbudka tageen. 2 Waxaa la
soo qaaday nin curyaannimo uurkii hooyadiis kala soo baxay
oo maalin walba la ag dhigi jiray albaabka macbudka oo la
odhan jiray Qurux Badane inuu kuwa macbudka gelayay

dawarsado. **3** Isagu, markuu arkay Butros iyo Yooxanaa
oo ku dhow inay macbudka galaan, ayuu dawarsaday
iyaga. **4** Markaasaa Butros, oo Yooxanaa la socdo, intuu
aad u fiiriyey isaga, ku yidhi, Na soo eeg. **5** Markaasuu u
fiirsaday iyaga, isagoo filanaya inuu iyaga wax ka helo. **6**
Laakiin Butros baa ku yidhi, Lacag iyo dahab midna ma
haysto, laakiin waxaan haystaan ku siinayaa. Magaca Ciise
Masiix, kii reer Naasared, ku soco. **7** Markaasuu intuu
gacanta midigtaa ku dhegay ayuu sara kiciyey; oo markiiba
cagihiisii iyo anqowyadiisiiba waa xoogaysteen. **8** Intuu kor
u booday ayuu istaagay oo socod bilaabay; markaasuu
iyaga macbudkii la galay, isagoo socda oo boodboodaya oo
Ilaah ammaanaya. **9** Dadkii oo dhammuna waxay arkeen
isagoo socda oo Ilaah ammaanaya; **10** markaasay waxay
garteen inuu isagu yahay kii Albaabkii Quruxda Badnaa
agtiisa dawarsiga u fadhiisan jiray; markaasay yaab iyo
amankaag ula dhinteen wixii ku dhacay isaga. **11** Oo intuu
Butros iyo Yooxanaa ku dhegganaa ayay dadkii oo dhammu
ku soo wada ordeen balbaladii la odhan jiray Balbaladii
Sulaymaan iyagoo aad u yaabsan. **12** Markuu Butros dadkii
arkay ayuu u jawaabay oo ku yidhi, Niman yahow reer binu
Israa'iil, Maxaad waxan ula yaabsan tihiin, ama maxaad
sidaas noogu fiirinaysaan sidii annagoo xooggayaga ama
cibaadadayada ku socodsiinnay isaga? **13** Ilaaha Ibraahim
iyo Isxaaq iyo Yacquub, oo ahaa Ilaaha awowayaasheen,
wuxuu ammaanay Midiidinkiisii Ciise, kii aad gacangeliseen
oo aad Bilaatos hortiisa ku diideen markuu goostay inuu sii
daayo. **14** Laakiin idinku waxaad diideen Kan Quduuska
iyo Xaqaba ah, oo waxaad weyddiisateen nin dhiig qaba in
laydiin sii daayo, **15** oo waxaad disheen Amiirkii nolosha, kan
Ilaah ka sare kiciyey kuwii dhintay, annaguna markhaatiyaal
baannu ka nahay. **16** Magiciisa ayaa xoogsiiyey kan aad
arkaysaan oo garanaysaan, rumaysadka uu magiciisa ku
rumaystay aawadiis. Rumaysadka uu ku rumaystay isaga
ayaa ninkan idinka oo dhan hortiinna ku siiyey caafimaadkan.
**17** Waxaanan ogahay, walaalayaalow, inaad tan aqoonla'aan
u samayseen, sidii madaxdiinnuba yeeshay oo kale. **18**
Laakiin Ilaah sidaasuu u dhammeeyey waxyaalihii uu hore
uga sheegay afafkii nebiyada oo dhan oo ahaa in Masiixu
silci doono. **19** Haddaba toobadkeena oo soo noqda, si
dembiyadiinna loo tirtiro, si ay wakhtiyo qabowjis lihii uga
yimaadaan Rabbiga hortiisa, **20** oo uu soo diro Ciise Masiix,
kii uu hore idiinku doortay, **21** kan ay waajibka tahay inay
samadu aqbasho tan iyo wakhtiyada la soo celinayo wax
walba oo Ilaah kaga hadlay afkii nebiyadiisii quduuska ahaa
tan iyo bilowgii. **(aiōn g165)** **22** Muuse wuxuu yidhi, Rabbiga
Ilaaha ahu wuxuu walaalihiinna dhexdooda idiinka kicin
doonaa nebi anoo kale ah. Waa inaad isaga ka dhegaysataan
wax kastuu idinku yidhaahdo. **23** Waxay noqon doontaa
in naf kastoo aan nebigaas dhegaysan dadka laga dhex
saari doono oo la baabbi'in doono. **24** Nebiyadii oo dhan
tan iyo Samuu'eel iyo kuwii ka dambeeyey, in alla intii
hadashay, waxay wada sheegeen maalmahan. **25** Waxaad
tihiin wiilashii nebiyada iyo wiilashii axdigii Ilaah la dhigtay
awowayaashiin, markuu Ibraahim ku yidhi, Qabiilooyinka
dunida oo dhammu farcankaagay ku barakoobi doonaan.
**26** Ilaah markuu Midiidinkiisii kiciyey, idinkuu markii hore
idiin soo diray inuu idin barakeeyo markuu midkiin kasta
dembiyadiisa ka soo jeediyo.

**4** Intay dadkii la hadlayeen ayaa wadaaddadii iyo sirkaalkii
macbudka iyo Sadukiintii u yimaadeen, **2** iyagoo ka
xumaaday, maxaa yeelay, waxay dadkii bareen oo Ciise
ku ogeysiiyeen sarakicidda kuwii dhintay. **3** Markaasay
qabqabteen oo xabbiseen ilaa maalintii ku xigtay, maxaa
yeelay, durba fiidkii bay ahayd. **4** Laakiin qaar badan oo
hadalkii maqlay waa rumaysteen; oo tiradii nimanku waxay
noqotay abbaaraha shan kun. **5** Markaasaa waxaa dhacday
in maalintii dambe taliyayaashoodii iyo waayeelladoodii iyo
culimmadoodii ay Yeruusaalem isugu soo wada urureen;
**6** waxaana joogay Annas oo ahaa wadaadkii sare, iyo
Kayafas, iyo Yooxanaa, iyo Aleksanderos, iyo in alla intii
wadaadka sare xigaalo la ahayd. **7** Oo intay dhexda soo
taageen bay weyddiiyeen oo ku yidhaahdeen, Xooggee
ama magacee baad waxan ku samayseen? **8** Markaasaa
Butros oo Ruuxa Quduuska ahi ka buuxo wuxuu iyaga ku
yidhi, Kuwiinnan dadka u taliya iyo waayeelladow, **9** haddii
maanta naloo imtixaamayo falimihii wanaagsanaa oo loo
sameeyey nin xoogdaran iyo sidii ninkan loo bogsiiyey, **10**
dhammaantiin ogaada, idinka iyo dadka reer binu Israa'iil
oo dhammu, in magaca Ciise Masiix, kii reer Naasared, oo
aad iskutallaabta ku qodobteen, oo Ilaah ka sara kiciyey
kuwii dhintay, daraaddiis ninkanu isagoo bogsaday halkan
hortiinna ah ku taagan yahay. **11** Isagu waa dhagixii idinkoo
wax dhisa aad diiddeen, oo noqday madaxa rukunka. **12** Mid
kale badbaadada lagama helo, maxaa yeelay, ma jiro magac
kale samada hoosteeda oo dadka dhexdooda loo bixiyey oo
waajib inoo ah inaynu ku badbaadno. **13** Markay arkeen
Butros iyo Yooxanaa dhiirranaantoodii, oo ay garteen inay
yihiin niman aan wax baran, jaahiliinna ah, ayay yaabeen;
markaasay garteen inay Ciise la joogi jireen. **14** Markay
arkeen ninkii la bogsiiyey oo la taagan iyaga, waxba way ka
odhan kari waayeen. **15** Laakiin intay amreen inay shirka
dibadda uga baxaan, ayay wada hadleen iyagoo leh, **16**

Maxaynu nimankan ku samaynaa? Waayo, inay calaamo
caan ah faleen waa u muuqataa kuwa Yeruusaalem jooga
oo dhan; mana dafiri karno. **17** Laakiin si ayan dadka ugu
sii faafin, aynu cabsiinno si ayan hadda ka dib magacan
ninna ugula hadlin. **18** Markaasay u yeedheen oo ku amreen
inayan aslanba Ciise magiciisa ku hadlin, waxna ku barin. **19**
Laakiin Butros iyo Yooxanaa ayaa u jawaabay iyagii oo ku
yidhi, Idinku kala xukuma inay Ilaah hortiisa ku qumman
tahay inaannu idinka idin maqallo intaannu Ilaah maqli
lahayn, iyo in kale; **20** waayo, waxyaalihii aannu aragnay
oo maqallay iskama dayn karno inaannu ka hadalno. **21**
Markaasay, intay sii cabsiiyeen, sii daayeen, waayo, waxay
waayeen waxay ku taqsiiraan, dadka aawadiis; maxaa
yeelay, dadkii oo dhammu waxay Ilaah ku ammaaneen wixii
la sameeyey. **22** Waayo, ninkii calaamadan lagu bogsiiyey
waa ka weynaa afartan sannadood. **23** Markii la sii daayay
ayay intoodii kale u yimaadeen oo uga warrameen wixii
wadaaddada sare iyo waayeelladu ku yidhaahdeen oo dhan.
**24** Oo markay taas maqleen, iyagoo isku wada qalbi ah,
ayay codkoodii sare ugu qaadeen Ilaah oo yidhaahdeen,
Rabbiyow, adigu waxaad tahay kan sameeyey samada, iyo
dhulka, iyo badda, iyo waxa ku jira oo dhan; **25** kii Ruuxa
Quduuska ah kaga hadlay afkii awowahayo Daa'uud oo ahaa
midiidinkaagii oo yidhi, Quruumuhu maxay u cadhoodeen,
Dadkuna maxay ugu fikireen wax aan waxba ahayn? **26**
Boqorrada dhulku col bay u taagnaayeen. Taliyayaashuna
intay is-urursadeen Ayay waxay caasi ku noqdeen Rabbiga
iyo Masiixiisa; **27** waayo, waxaa run ah in magaaladan
gudaheeda Herodos iyo Bontiyos Bilaatos oo ay la jiraan
dadka aan Yuhuudda ahayn iyo dadka reer binu Israa'iil
iyagoo ka gees ah Ciise Midiidinkaaga quduuska ah, oo
aad subagtay, ay isu urursadeen, **28** inay sameeyaan wax
alla wixii gacantaada iyo taladaadu hore u gooyeen inay
noqdaan. **29** Laakiin Rabbiyow, eeg, way na cabsiinayaane;
haddaba addoommadaada sii dhiirranaan oo dhan oo ay
ereygaaga ku sheegaan, **30** intii aad gacantaada u soo
fidinaysid si aad ugu bogsiisid, si calaamooyin iyo yaabab
ugu samaysmaan magaca Midiidinkaaga quduuska ah
Ciise. **31** Oo markay tukadeen dabadeed, meeshay ku
ururSanaayeen baa gariirtay; oo dhammaantood waxaa ka
wada buuxsamay Ruuxa Quduuska ah, oo ereygii Ilaah
bay dhiirranaan ugu hadleen. **32** Oo intoodii badnayd oo
rumaysatay isku qalbi iyo naf bay ahaayeen; midkoodna ma
odhan, Waxaan leeyahay waa waxaygii, laakiin wax waluba
waa ka dhexeeyeen. **33** Oo rasuulladu xoog weyn bay
sarakicidda Rabbi Ciise uga marag fureen; oo nimco badan
baa dhammaantood ku soo dul degtay. **34** Mid wax la'aana
iyaga kuma jirin, waayo, in alla intii dhul ama guryo lahayd
way iibiyeen, oo qiimihii wixii la iibiyey ayay keeneen, **35** oo
rasuullada soo hor dhigeen; oo waxaa wax loo qaybshay
mid kasta siduu wax ugu baahnaa. **36** Markaasaa Yuusuf oo
rasuulladu ugu yeedhi jireen Barnabas, kan lagu micneeyey
Wiilkii dhiirigelinta, oo qoladiisu Laawi ahayd oo reer Qubrus
u dhashay, **37** intuu beer uu lahaa iibshay ayuu lacagtii
keenay oo soo hor dhigay rasuullada.

**5** Laakiin nin Ananiyas la odhan jiray, isagoo haweenaydiisii
Safira la jirto, ayuu xoolihiisii qaar iibshay, **2** markaasuu
qiimihii, haweenaydiisii oo la og, intuu qaar la hadhay, qaar
keenay oo rasuulladii soo hor dhigay. **3** Laakiin Butros baa ku
yidhi, Ananiyasow, maxaa Shayddaanku qalbigaaga u geliyey
inaad Ruuxa Quduuska ah been u sheegtid oo aad qiimihii
dhulka qaar la hadhid? **4** Markaad haysatay, miyaanay
waxaagii ahayn? Oo markii la iibshay dabadeedna, miyaanad
adigu u talin? Maxaad waxan qalbigaaga u gelisay? Dad
been uma aad sheegin, waxaadse u sheegtay Ilaah. **5** Markii
Ananiyas hadalladaas maqlay ayaa, intuu dhulka ku dhacay,
naftii ka dhacday; oo kuwii taas maqlay oo dhan cabsi weyn
baa gashay. **6** Markaasaa nimankii dhallinyarada ahaa, intay
kaceen, isagay duudduubeen, markaasay qaadeen oo soo
aaseen. **7** Abbaaraha saddex saacadood dabadeed ayaa
haweenaydiisii soo gashay iyadoo aan ogayn wixii dhacay. **8**
Markaasaa Butros u jawaabay oo ku yidhi, Inaad dhulkii
intaas ku iibiseen iyo in kale, ii kala sheeg. Markaasay tidhi,
Haah, intaasaannu ku iibinnay. **9** Laakiin Butros baa ku yidhi,
Sidee baad ugu heshiiseen inaad Ruuxa Rabbiga jirrabtaan?
Bal eeg, kuwii ninkaaga soo aasay cagahoodii albaabka
agtiisay ka soo sanqadhayaane. Adigana way ku qaadi
doonaan. **10** Markiiba intay ku hor dhacday isaga, ayaa naftii
ka dhacday; markaasaa nimankii dhallinyarada ahaa soo
galeen, oo waxay arkeen iyadoo meyd ah, markaasay intay
qaadeen ku aaseen ninkeedii agtiisa. **11** Markaasaa cabsi
weyni gashay kiniisaddii iyo kuwii waxyaalahaas maqlay oo
dhan. **12** Rasuulladii waxay gacmahooda dadka dhexdiisa
ku sameeyeen calaamooyin iyo yaabab badan; iyagoo
isku wada qalbi ah ayay waxay wada joogeen Balbaladii
Sulaymaan. **13** Laakiin kuwii kale midkoodna kuma dhicin
inuu iyaga ku darmado, hase ahaatee dadkii waa sharfeen
iyaga; **14** oo waxaa ku soo kordhay iyaga kuwa badan
oo Rabbiga rumaystay, oo rag iyo dumarba leh; **15** xataa
waxay noqotay inay kuwii bukay jidadka u soo saareen
oo ku jiifiyeen sariiro iyo dermooyin si hooskiisu u dul
maro qaarkood, markii Butros uu soo maro. **16** Oo waxaa
kaloo ku soo ururay dad badan oo ka yimid magaalooyinkii

Yeruusaalem ku wareegsanaa, iyagoo wada dad buka iyo
kuwo jinniyo wasakh lahu derdereen; oo kulligood waa la
wada bogsiiyey. 17 Laakiin waxaa kacay wadaadkii sare
iyo kuwii la socday oo dhan, kuwaas oo ka mid ahaa
dariiqada Sadukiinta; markaasay iyagoo aad u xanaaqsan,
18 intay rasuulladii qabqabteen, xabsi ku rideen. 19 Laakiin
malaa'igtii Rabbiga ayaa habeennimo albaabbadii xabsiga
ka furtay, oo intay dibadda u soo saartay, ku tidhi, 20
Taga oo macbudka isdhex taaga, oo waxaad dadka kula
hadashaan erayada oo dhan ee Noloshan. 21 Markay taas
maqleen ayay, intay aroortii macbudkii galeen, dadkii wax
bareen. Laakiin wadaadkii sare iyo kuwii la jiray ayaa yimid,
oo waxay isugu yeedheen shirkii iyo duqowdii reer binu
Israa'iil oo dhan, markaasay cid u direen xabsigii in kuwii
xidhnaa laga keeno. 22 Laakiin saraakiishu markay xabsiga
yimaadeen waa ka waayeen iyagii; markaasay shirkii ku
noqdeen oo u warrameen, 23 oo waxay ku yidhaahdeen,
Waxaannu aragnay xabsigii oo aad u xidhan, oo nimankii
ilaalinayayna albaabbada ka taagan yihiin; laakiin markaannu
furnay, ninna waa ka waynay. 24 Haddaba markii sirkaalkii
macbudka iyo wadaaddadii sare hadalladaas maqleen,
waxay la fajaceen waxyaalahaasu waxay noqon doonaan. 25
Mid baa intuu u yimid ku yidhi, Ogaada, nimankii aad xabsiga
ku riddeen, macbudkay dhex taagan yihiin, oo dadkay wax
ku barayaane. 26 Markaasaa sirkaalkii, isagoo saraakiil kale
la socoto, intuu tegey, rabshadla'aan u soo kaxeeyey; waayo,
waxay ka baqeen dadku inuu dhagxiyo. 27 Markaasay,
intay soo kaxeeyeen, shirka soo hor taageen. Kolkaasaa
wadaadkii sare weyddiiyey, 28 oo yidhi, Waxaannu aad
idiinku amarnay inaydnaan magacan wax ku barin; laakiin bal
eega, waxaad Yeruusaalem ka buuxiseen waxbariddiinnii,
oo weliba waxaad damacsan tihiin inaad ninkan dhiiggiisii
dusha naga saartaan. 29 Laakiin Butros iyo rasuulladii
ayaa u jawaabay oo ku yidhi, Waa inaannu Ilaah addeecno
intaannu dad addeeci lahayn. 30 Ilaahii awowayaashayo
ayaa soo sara kiciyey Ciisihii aad geedka ku deldesheen
oo disheen. 31 Ilaah baa isaga gacantiisa midigeed sare
ugu qaaday inuu ahaado Amiir iyo Badbaadiye si uu Israa'iil
toobad iyo dembidhaaf u siiyo. 32 Waxyaalahaas annagaa
ka marag ah, waxaa kaloona ka marag ah Ruuxa Quduuska
ah oo Ilaah siiyey kuwa addeeca isaga. 33 Laakiin markay
taas maqleen, way ka xanaaqeen, oo waxay ku tashadeen
inay laayaan. 34 Laakiin waxaa shirkii iska dhex taagay mid
Farrisiinta ka mid ahaa oo la odhan jiray Gamalii'eel, kaas
oo ahaa macallinkii sharciga, dadkuna aad u maamuusi
jireen, oo wuxuu amray in nimanka dibadda cabbaar loo
saaro. 35 Markaasuu iyagii ku yidhi, Niman yahow reer binu
Israa'iil, iska jira waxaad la damacsan tihiin inaad nimankaas
ku samaysaan. 36 Maxaa yeelay, hadda ka hor waxaa kacay
Tudas, isagoo nin weyn iska dhigaya, kaasoo niman badan
oo qiyaas afar boqol gaadhaa raaceen. Isagii waa la dilay, oo
intii addeecday oo dhammuna way kala firdheen, oo waxay
noqdeen wax aan waxba ahayn. 37 Ninkaas dabadiis, waagii
dadka la qori jiray, waxaa kacay Yuudas kii reer Galili, oo
dad buu duufsaday; isaguna waa dhintay, oo intii addeecday
oo dhammuna way kala firdheen. 38 Haddaba waxaan idinku
leeyahay, Nimankan faraha ka qaada oo iska daaya; waayo,
taladan ama shuqulkanu hadday dad ka yimaadeen, waa
baabbi'i doonaan; 39 laakiin hadday Ilaah ka yimaadeen,
ma baabbi'in kari doontaan; haddii kale malaha waxaa la
ogaan doonaa inaad Ilaah la diriraysaan. 40 Markaasay
ku raaceen isaga; oo intay rasuulladii u yeedheen, ayay
garaaceen, oo waxay ku amreen inayan magaca Ciise
ku hadlin, markaasay sii daayeen. 41 Markaasay shirkii
hortiisii ka tageen, iyagoo ku faraxsan in lagu tiriyey inay
istaahilaan in Magaca aawadiis loo maamuus jebiyo. 42
Maalin walba macbudka dhexdiisa iyo guryahaba kama ay
joojin inay dadka baraan oo ku wacdiyaan wax ku saabsan
Ciise Masiix.

6 Waagaas waxaa dhacay, intii xertu badnaysay,
in Yuhuuddii Gariigta ahayd ay ka gunuunaceen
Cibraaniyadii, maxaa yeelay, carmalladoodii laga dhintay
wixii maalin walba la siin jiray looguma hagarbixin. 2
Markaasaa laba-iyo-tobankii, intay isugu yeedheen kuwa
badan oo xerta ka mid ahaa, waxay ku yidhaahdeen, Ma
wanaagsana inaannu ereyga Ilaah iska dayno oo aannu
miisas ka adeegno. 3 Haddaba, walaalayaalow, waxaad
dhexdiinna ka xushaan toddoba nin oo sharaf leh, oo ay
ka buuxaan Ruuxa iyo xigmaddu, oo aynu u dooranno
shuqulkan. 4 Annaguse waxaannu ku sii adkaysan doonnaa
tukasho iyo shuqulka ereyga. 5 Hadalkiina waa ka wada
farxiyey dadkii badnaa oo dhan; oo waxay doorteen Istefanos
oo ahaa nin ay ka buuxaan rumaysad iyo Ruuxa Quduuska
ahu, iyo Filibos, iyo Barokhoros, iyo Nikanoor, iyo Timoon, iyo
Barmenaas, iyo Nikolas kii reer Antiyokh oo diinta soo galay.
6 Kuwaasay rasuulladii hor keeneen; oo markay tukadeen
dabadeed, ayay gacmahoodii saareen. 7 Markaasaa ereygii
Ilaah faafay, tiradii xertiina Yeruusaalem aad ugu badatay,
oo tiro badan oo wadaaddo ahina iimaankay yeeleen. 8
Markaasaa Istefanos oo ay nimco iyo xoog ka buuxaan
ayaa dadka dhexdiisa ku sameeyey yaabab iyo calaamooyin
waaweyn. 9 Laakiin waxaa kacay oo Istefanos la murmay
kuwii sunagogga la odhan jiray sunagogga Libertiinta, iyo

kan reer Kuranaya, iyo reer Iskanderiya, iyo kuwa Kilikiya iyo
Aasiya. 10 Iyaguna waa is-hor taagi kari waayeen xigmaddii
iyo Ruuxii uu ku hadlay. 11 Markaasay niman laaluusheen,
oo nimankii baa waxay yidhaahdeen, Waxaannu maqalnay
isagoo Muuse iyo Ilaahba caayaya. 12 Markaasay kiciyeen
dadkii iyo waayeelladii iyo culimmadii, oo intay isagii ku soo
kediyeen oo qabteen, ayay shirkii geeyeen. 13 Markaasay
waxay soo taageen markhaatiyaal been ah oo leh, Ninkanu
iskama daayo inuu meeshan quduuska ah iyo sharciga erayo
xunxun ka sheego, 14 waayo, waxaannu maqalnay isagoo
leh, Ciisahan reer Naasared meeshan buu dumin doonaa,
wuxuuna beddeli doonaa caadooyinkii Muuse inooga tegey.
15 Oo kuwii shirka wada fadhiyey oo dhan, iyagoo aad u
fiirinaya, waxay arkeen wejigiisii oo ah sidii weji malaa'igeed
oo kale.

7 Markaasaa wadaadkii sare wuxuu yidhi, Waxanu ma
saasaa? 2 Markaasuu ku yidhi, Walaalo iyo aabbayaalow,
dhegaysta, Ilaaha Ammaantu wuxuu u muuqday awoweheen
Ibraahim markuu Mesobotamiya joogay intuusan Haaraan
degin, 3 oo wuxuu ku yidhi, Ka soo kac waddankaaga iyo
dadkaaga, oo kaalay dalka aan ku tusi doono. 4 Markaasuu
ka soo kacay dalkii reer Kaldayiin oo wuxuu soo degay
Haaraan; oo markuu aabbihiis dhintay ayaa Ilaah meeshaas
isaga ka soo wareejiyey oo keenay dalkan aad haatan
deggan tihiin, 5 oo dhaxalna kama uu siin, xataa meel uu
cagtiisa dhigo; laakiin wuxuu isaga ka ballanqaaday inuu
dalka mulki u siiyo isaga iyo farcankiisa ka dambeeyaba, in
kastoo uusan dhal lahayn. 6 Ilaah sidan buu u hadlay, in
farcankiisu degi doono dal shisheeye, oo iyaga la addoonsan
doono, oo afar boqol oo sannadood la dhibi doono. 7 Ilaah
wuxuu yidhi, Quruunta iyagu ay u addoonsamaan ayaan
xukumi doonaa; markaas dabadeed ayay ka soo bixi doonaan
oo meeshan iigu adeegi doonaan. 8 Oo wuxuu isaga siiyey
axdiga gudniinta; haddaba Ibraahim wuxuu dhalay Isxaaq,
oo maalintii siddeedaad ayuu guday isaga; Isxaaqna wuxuu
dhalay Yacquub; Yacquubna wuxuu dhalay laba-iyo-tobankii
aynu ka soo farcannay. 9 Kuwii aan ka soo farcannayna
intay Yuusuf ka masayreen ayay waxay ka iibiyeen Masar;
10 laakiin Ilaah baa isaga la jiray oo dhibaatadiisii oo dhan ka
samatabbixiyey, oo axsaan iyo xigmad ka siiyey Fircoon, oo
ahaa boqorkii Masar; markaasuu isaguna wuxuu isagii taliye
uga dhigay Masar iyo reerkiisii oo dhan. 11 Haddaba waxaa
Masar iyo Kancaan oo dhan ka wada dhacay abaar iyo
dhibaato weyn; awowayaasheenna dhuuni bay ka waayeen.
12 Laakiin markii Yacquub maqlay in Masar sarreen jiro, ayuu
markii ugu horraysay awowayaasheen diray. 13 Oo markii
labaad waxaa walaalihiis la aqoonsiiyey Yuusuf; markaasaa
Fircoon wuxuu gartay Yuusuf qoladiisii. 14 Markaasaa Yuusuf
cid u diray oo u yeedhay aabbihiis Yacquub iyo dadkiisii
oo dhan oo ahaa shan iyo toddobaatan qof. 15 Markaasaa
Yacquub Masar tegey. Isaga qudhiisii waa dhintay iyo
awowayaasheenba; 16 waxaana la geeyey Shekem oo la
dhigay xabaashii Ibraahim qiimaha lacagta ah kaga iibsaday
wiilashii Xamoor oo Shekem joogay. 17 Laakiin markuu soo
dhowaaday wakhtigii ballankii Ilaah kula ballamay Ibraahim,
ayay dadkii ku soo kordheen oo ku bateen Masar, 18 tan iyo
intii boqor kale oo aan Yuusuf oqooni Masar ka kacay. 19
Isaguna waa khiyaaneeyey dadkeenna, awowayaasheenna
wuu xumeeyey, oo wuxuuna ku qasbay inay ilmahoodii
yaryaraa iska tuuraan si ayan u sii noolaan. 20 Muusena
wakhtigaasuu dhashay, oo wuxuu ahaa wax qurux badan;
oo saddex bilood ayaa gurigii aabbihiis lagu hayay; 21
markii la tuurayna, Fircoon gabadhiisii ayaa qaadatay oo sidii
wiilkeedii oo kale u korsatay. 22 Muusena waxaa la baray
xigmaddii Masriyiinta oo dhan; hadalladiisa iyo falimihiisana
xoog buu ku lahaa. 23 Laakiin markuu gaadhay afartan
sannadood oo buuxa ayaa waxaa qalbigiisa gashay inuu
walaalihiis oo reer binu Israa'iil ahaa soo booqdo. 24 Oo
markuu arkay midkood oo lagu gardarroonayo, ayuu ka
celiyey, oo intuu kii la dulmayay uu aarguday, ayuu Masrigii
dilay; 25 oo wuxuu u malaynayay in walaalihiis garteen
sida Ilaah gacantiisa iyaga ugu samatabbixinayo, laakiin ma
ay garan. 26 Oo maalintii ku xigtay ayuu iyagoo diriraya u
yimi, oo wuxuu damcay inuu heshiisiiyo, markaasuu yidhi,
Niman yahow, walaalaad tihiine; maxaad isu dulmaysaan?
27 Laakiin kii deriskiisii dulmayay, ayaa isaga iska riixay oo ku
yidhi, Yaa nooga kaa dhigay taliye iyo xaakin? 28 Ma waxaad
doonaysaa inaad ii dishid sidaad Masrigii shaalay u dishay?
29 Markaasaa Muuse hadalkaas aawadiis cararay, oo sidii
ajanabi buu dalka Midyaan u degganaa, meeshaasna laba
wiil buu ku dhalay. 30 Markii afartan sannadood dhammaatay
dabadeed ayaa waxaa isagii Buur Siinay cidladeedii uga
muuqatay malaa'ig ku dhex jirta geed dab ka ololayo.
31 Oo markii Muuse arkay ayuu wuxuu arkay la yaabay,
oo intuu u soo dhowaanayay inuu arko, ayaa waxaa u
yimid codkii Rabbiga oo leh, 32 Anigu waxaan ahay Ilaaha
awowayaashaa, Ilaaha Ibraahim iyo Ilaaha Isxaaq iyo Ilaaha
Yacquub. Markaasaa Muuse gariiray oo ku dhici waayay
inuu eego. 33 Markaasaa Rabbigu isaga ku yidhi, Kabaha
cagahaaga ka furfur; maxaa yeelay, meesha aad ku taagan
tahay waa dhul quduus ah. 34 Dadkayga Masar jooga
rafaadkooda waan arkay, taahoodana waan maqlay, oo
waxaan u imid inaan samatabbixiyo; haddaba kaalay, Masar

baan kuu diri doonaaye. 35 Muusahakan ay diideen oo ku
yidhaahdeen, Yaa kaa dhigay taliye iyo xaakin? Isagaa Ilaah
ugu soo diray gacanta malaa'igtii geedka uga soo muuqatay
inuu ahaado taliye iyo samatabbixiye. 36 Kanaa iyaga Masar
ka soo saaray, oo yaabab iyo calaamooyin ku sameeyey
Masar, iyo Badda Cas, iyo cidlada afartan sannadood.
37 Kanu waa Muusihii ku yidhi reer binu Israa'iil, Ilaah
wuxuu walaalihiin idiinka dhex kicin doonaa nebi sidayda
oo kale. 38 Kanu waa kii ku dhex jiray kiniisaddii cidlada
oo la jiray malaa'igtii isaga kala hadashay Buur Siinay iyo
awowayaasheen, kii la siiyey hadallada nool inuu ina siiyo.
39 Isaga awowayaasheen ma ay doonaynin inay addeecaan,
laakiin intay iska riixeen ayay qalbigooda geliyeen inay Masar
dib ugu jeestaan, 40 oo waxay Haaruun ku yidhaahdeen,
Inoo samee ilaahyo ina hor socda; maxaa yeelay, Muusihii
inaga soo kaxeeyey dhulka Masar garan mayno waxa ku
dhacay. 41 Markaasay waxay wakhtigaas sameeyeen weyl,
oo sanamkii waxay u keeneen allabari, oo waxay ku farxeen
shuqulkii gacmahoodu sameeyeen. 42 Laakiin Ilaah baa
ka jeestay, oo wuxuu faraha uga qaaday inay u adeegaan
guutada samada; sida ay ugu qoran tahay kitaabka nebiyada,
Bal reer binu Israa'iilow, afartankii sannadood oo aad cidlada
joogteen, Ma anigaad i siiseen xoolo qalan iyo allabaryo? 43
Weliba waxaad qaadateen taambuuggii Molokh Iyo xiddigtii
ilaaha Remfan, Oo ah waxyaalihii aad u samaysateen
inaad caabuddaan. Haddaba waxaan idiin kaxayn doonaa
Baabuloon shishadeeda. 44 Awowayaasheen waxay cidlada
ku hayeen taambuuggii maragga, sidii kii Muuse la hadlay
ugu amray isaga inuu u sameeyo sidii qaabkii uu arkay.
45 Kaas ayaa awowayaasheen markoodii la soo qaadeen
Yashuuca markay galeen oo qaateen dhulkii quruumihii Ilaah
awowayaasheen hortooda ku eryay, ilaa waagii Daa'uud. 46
Daa'uudna Ilaah hortiis ayuu wanaag ka helay, oo wuxuu
weyddiistay inuu Ilaahii Yacquub u helo meel uu dego. 47
Laakiinse Sulaymaan baa guri u dhisay. 48 Hase ahaatee
Kan ugu sarreeya ma dego guryo gacmo lagu sameeyo; sida
nebigu leeyahay, 49 Samadu waa carshigayga, Dhulkuna waa
meeshaan cagaha saarto, Rabbigu wuxuu leeyahay, Guri
caynmaad ii dhisi doontaan? Ama maxay tahay meeshaan
ku nastaa? 50 Miyaan gacantaydu samayn waxyaalahan
oo dhan? 51 Idinkan madaxa adag oo aan qalbiga iyo
dhegaha laga gudinow, weligiinba Ruuxa Quduuska ah
waad hor joogsataan. Sidii awowayaashiin yeeli jireen oo
kale ayaad idinna yeeshaan. 52 Bal nebiyada kee baan
awowayaashiin silcin? Xataa iyagu waxay dileen kuwii hore
u sheegay imaatinka Kan xaqa ah; kan idinku aad haatan
gacangeliseen oo disheen. 53 Waxaad sharciga u hesheen
sidii wax malaa'igahu hagaajiyeen, laakiinse ma aydnaan
xajin. 54 Haddaba markay waxyaalahaas maqleen way ka
xanaaqeen oo u ilka jirriqsadeen isaga. 55 Laakiin isagoo
Ruuxa Quduuska ahu ka buuxo ayuu samada aad u fiiriyey,
oo wuxuu arkay ammaanta Ilaah iyo Ciise oo midigta Ilaah
taagan, 56 oo wuxuu yidhi, Bal eega, waxaan arkayaa
samooyinkii oo la furay iyo Wiilkii Aadanaha oo midigta
Ilaah taagan. 57 Laakiin markaasay cod weyn ku qayliyeen
oo dhegaha furaysteen, oo iyagoo isku wada qalbi ah ku
yaaceen isagii. 58 Markaasay intay magaalada ka soo
saareen dhagxiyeen; kuwii maragga ahaana dharkoodii
waxay ag dhigteen nin dhallinyaro ah oo la odhan jiray
Sawlos. 59 Markaasay dhagxiyeen Istefanos oo Rabbiga
baryaya oo ku leh, Rabbi Ciisow, ruuxayga qaado. 60
Markaasuu jilba joogsaday oo cod weyn ku qayliyey oo
ku yidhi, Rabbiyow, dembigan dushooda ha ka dhigin. Oo
markuu sidaas yidhi, ayuu dhintay.

**8** Sawlosna raalli buu ka ahaa dililddiisa. Oo maalintaas
kiniisaddii Yeruusaalem ku tiil aad baa loo silciyey; oo
dhammaantoodna rasuulladii mooyaane waxay ku kala
firdheen dalalka Yahuudiya iyo Samaariya. 2 Markaasaa
niman cibaado leh Istefanos aaseen oo aad ugu baroorteen.
3 Laakiin Sawlos aad buu kiniisadda u rafaadiyey, oo intuu
guri walba galay, ayuu rag iyo dumarba ka soo jiiday,
oo xabsi ku riday. 4 Haddaba kuwii kala firidhsanaa,
meel walba oo ay mareenba ereygii bay ku wacdiyeen. 5
Markaasaa Filibos wuxuu tegey magaalada Samaariya, oo
wuxuu dadka ku wacdiyey Masiixa. 6 Oo dadkii badnaa,
iyagoo isku wada qalbi ah, ayay dhegaysteen wuxuu Filibos
ku hadlay markay waxyaalahaas maqleen oo ay arkeen
calaamooyinkuu sameeyey. 7 Waayo, kuwo badan oo jinniyo
wasakh leh qabay, jinniyadii oo cod weyn ku qaylinaya
ayaa ka soo baxay, oo kuwo badan oo curyaan ahaa iyo
laangadhayaashiiba waa la bogsiiyey. 8 Magaaladaasna
aad baa looga farxay. 9 Waxaa jiray nin Simoon la odhan
jiray oo markii hore magaalada wax ku sixri jiray oo dadka
reer Samaariya ka yaabin jiray, isagoo isugu sheegaya
inuu yahay nin weyn. 10 Isagay dhammaantood, yar iyo
weynba, wada dhegaysan jireen oo odhan jireen, Ninkanu
waa xooggii Ilaah oo la odhan jiray Weyne. 11 Sababtii ay
u dhegaysteenna waxay ahayd inuu wakhti dheer iyaga
sixirkiisa kaga yaabiyey. 12 Laakiin markay rumaysteen
injiilka boqortooyada Ilaah iyo magaca Ciise Masiix oo Filibos
ku wacdiyey ayaa iyaga rag iyo dumarba la baabtiisay. 13
Simoon qudhiisuna waa rumaystay, oo markii la baabtiisay
dabadeed, had iyo goorba wuxuu la socon jiray Filibos,

wuuna la yaabay markuu arkay calaamooyinkii iyo yaababkii
waaweynaa oo uu sameeyey. 14 Haddaba markii rasuulladii
Yeruusaalem joogay maqleen in Samaariya ereygii Ilaah
aqbashay, ayay waxay u soo direen Butros iyo Yooxanaa,
15 kuwaasoo markay yimaadeen, u duceeyey iyaga inay
Ruuxa Quduuska ah helaan; 16 maxaa yeelay, midkoodna
weli kuma uu soo degin; laakiinse magaca Rabbi Ciise oo
keliya ayaa lagu baabtiisay. 17 Markaasay gacmahooda
saareen, oo waxay heleen Ruuxa Quduuska ah. 18 Haddaba
Simoon markuu arkay in markii rasuulladu gacmahooda
saareen, waxaa la siiyey Ruuxa Quduuska ah, ayuu lacag
u taagay, 19 isagoo leh, Anigana i siiya xooggan in nin
kastoo aan gacmahayga saaroba, uu helo Ruuxa Quduuska
ah. 20 Laakiin Butros baa wuxuu ku yidhi, Lacagtaadu
ha kula baabba'do, maxaa yeelay, waxaad u malaysay in
hadiyadda Ilaah lacag lagu helo. 21 Xaalkan kuma lihid ama
qayb ama badh; maxaa yeelay, qalbigaagu Ilaah hortiisa
kuma qummana. 22 Sidaas aawadeed xumaantaadan ka
toobadkeen, Rabbigana ka bari in fikirka qalbigaaga lagaa
cafiyo. 23 Waayo, waxaan arkaa adigoo ku jira xammeetida
qadhaadhnimada, kuna xidhan xaqdarrada. 24 Markaasaa
Simoon u jawaabay oo wuxuu ku yidhi, Rabbiga ii barya inaan
waxyaalahaas aad ku hadasheen midkoodna igu dhicin. 25
Haddaba iyagu markay marag fureen oo Rabbiga ereygiisa
ku hadleen, waxay ku noqdeen Yeruusaalem, waxayna
tuulooyin badan oo reer Samaariya ah ku wacdiyeen injiilka.
26 Laakiin Rabbiga malaa'igtiisa ayaa waxay la hadashay
Filibos, iyadoo ku leh, Kac oo aad xagga koonfureed, oo
waxaad raacdaa jidka Yeruusaalem ka taga ilaa Gaasa
taasoo cidla ah. 27 Wuuna u kacay oo aaday; oo waxaana
ku soo baxay nin bohon oo Xabashi ah oo amar weyn
ka hoos hayay Kandake boqoraddii Xabashida, wuuna u
talin jiray maalkeeda oo dhan, wuxuuna Yeruusaalem u
yimid inuu Ilaah caabudo. 28 Kolkuu ka soo noqonayay,
ayuu ku fadhiyey gaadhifaraskiisa, oo wuxuu akhriyeyey
kitaabka nebi Isayos. 29 Ruuxuna wuxuu Filibos ku yidhi,
Ku dhowow, oo gaadhigan raac. 30 Oo Filibos markuu ku
orday, wuxuu maqlay isagoo akhriyaya kitaabka nebi Isayos,
wuxuuna ku yidhi, Ma garanaysaa waxaad akhriyaysid? 31
Kolkaasuu yidhi, Sidee baan ku garan karaa in lay toosiyo
mooyaane? Markaasuu Filibos ka baryay inuu soo fuulo oo
la fadhiisto. 32 Haddaba meeshuu Qorniinka ka akhriyeyey
waa tan, Isaga sidii wan la qalayo baa loo kaxeeyey; Oo
sidii lax ku aamusan ninka dhogorta ka xiira hortiisa, Isagu
afkiisa ma uu furo; 33 Intuu is-hoosaysiiyey baa gartiisii
laga qaaday; Farcankiisii yaa sheegi doona? Maxaa yeelay,
noloshiisa dhulkaa laga qaaday. 34 Bohonku wuxuu Filibos u
jawaabay oo ku yidhi, Waxaan kaa baryayaa, Nebigu yuu
ka hadlayaa? Ma isaga qudhiisaa mise waa mid kale? 35
Filibos baa afkiisa furay, oo intuu Qorniinkan ka bilaabay
ayuu isaga ku wacdiyey Ciise. 36 Kolkay waddada marayeen
waxay yimaadeen meel biyah, bohonkuna wuxuu yidhi, Bal
eeg, waa biyo. Maxaa iga celinaya in lay baabtiiso? 37 Oo
Filibos wuxuu ku yidhi, Haddaad qalbigaaga oo dhan ka
rumaysatid, waa suurtowdaa. Wuuna u jawaabay oo yidhi,
Waxaan rumaysanahay in Ciise Masiix yahay Wiilka Ilaah.
38 Markaasuu amray in gaadhigu joogsado; labadooduna
biyahay galeen, Filibos iyo bohonkuba, oo wuu baabtiisay
isaga. 39 Oo markay biyihii ka soo baxeen, ayuu Ruuxii
Rabbigu dhuftay Filibos, bohonkuna mar dambe ma uu
arkin isagii, maxaa yeelay, jidkiisii ayuu iska qaaday isagoo
faraxsan. 40 Laakiin Filibos waxaa laga helay Asootos, oo
magaalooyinkuu dhex marayay oo dhan wuxuu ku wacdiyey
injiilka ilaa intuu gaadhay Kaysariya.

**9** Laakiin Sawlos oo weli dhaaranaya inuu cabsiiyo oo dilo
xerta Rabbiga, ayuu wuxuu u tegey wadaadkii sare, 2 oo
weyddiistay warqado uu la tago Dimishaq ilaa sunagogyada,
si hadduu helo dadkii Jidka, ha ahaadeen rag ama dumarba,
uu iyagoo xidhxidhan Yeruusaalem u keeno. 3 Oo kolkuu
sodcaalay, waxaa dhacday inuu Dimishaq u soo dhowaaday;
oo dhaqsiba waxaa hareerihiisa ka iftiimay iftiin samada ka
yimid. 4 Markaasuu dhulka ku dhacay, oo wuxuu maqlay cod
isaga ku leh, Sawlosow, Sawlosow, maxaad ii silcinaysaa? 5
Markaasuu ku yidhi, Yaad tahay, Sayidow? Wuxuuna ku
yidhi, Waxaan ahay Ciisaha aad silcinaysid; 6 laakiin kac oo
magaalada gal, oo waxaa laguu sheegi doonaa wixii kugu
waajib ah inaad samaysid. 7 Nimankii la sodcaalayayna
hadalla'aan bay istaageen, iyagoo codkii maqlaya laakiin aan
ninna arkaynin. 8 Markaasaa Sawlos dhulkii ka kacay; markii
indhihiisii furmeenna, waxba ma uu arkin; markaasay gacanta
ku hageen oo Dimishaq keeneen. 9 Saddex maalmood ayuu
aragla'aan joogay, waxbana ma cunin, waxbana ma cabbin.
10 Haddaba waxaa Dimishaq joogay nin xer ah oo la odhan
jiray Ananiyas; oo Rabbigu wuxuu kula hadlay riyo, isagoo ku
leh, Ananiyasow. Isna wuxuu ku yidhi, Waa i kan, Rabbiyow.
11 Markaasaa Rabbigu wuxuu ku yidhi, Kac oo aad jidka la
yidhaahdo Toosane, oo waxaad guriga Yuudas ka doontaa
nin la yidhaahdo Sawlos oo reer Tarsos ah; oo bal eeg, waa
tukanayaaye; 12 oo wuxuu arkay nin la yidhaahdo Ananiyas
isagoo u soo gelaya oo gacmihiisa dul saaraya inuu araggiisii
helo. 13 Laakiin Ananiyas baa u jawaabay oo ku yidhi,
Rabbiyow, waxaan dad badan ka maqlay ninkanu intuu shar
badan u gaystay quduusiintaada Yeruusaalem jooga; 14

halkanna wuxuu wadaaddada sare ka haystaa amar inuu
xidhxidho kuwa magacaaga kuugu yeedha oo dhan. 15
Laakiin Rabbigu wuxuu ku yidhi, Soco, maxaa yeelay, wuxuu
ii yahay weel aan doortay inuu magacayga hor geeyo dadka
aan Yuhuudda ahayn iyo boqorrada iyo reer binu Israa'iil; 16
maxaa yeelay, waxaan tusi doonaa waxyaalaha waajib ku ah
inuu u silco magacaygii dartiis. 17 Markaasaa Ananiyas tegey
oo gurigii galay, oo intuu gacmihiisa dul saaray, ayuu wuxuu
ku yidhi, Walaal Sawlosow, Rabbi Ciise oo kuugu muuqday
jidkaad ku timid baa ii soo diray inaad araggaaga heshid iyo
in Ruuxa Quduuska ahu kaa buuxsamo. 18 Oo markiiba
waxaa indhihiisa ka soo dhacay wax xuubab u eg, wuuna
helay araggiisii; markaasuu kacay oo waa la baabtiisay; 19
cunto buuna cunay, waana xoogaystay. Haddaba dhawr
maalmood ayuu la joogay xertii Dimishaq joogtay. 20 Oo
markiiba sunagogyada dhexdooda ayuu dadka kaga dhex
wacdiyey Ciise inuu yahay Wiilka Ilaah. 21 Dadkii maqlay oo
dhammuna waa yaabeen, oo waxay yidhaahdeen, Kanu
sow ma aha kii Yeruusaalem ku layn jiray kuwa magacaas
ugu yeedhi jiray? Oo sababtaas ayuu halkan u yimid inuu
iyagoo xidhxidhan hor keeno wadaaddada sare. 22 Laakiin
Sawlos xooggiisii baa u sii kordhay, wuuna wareeriyey
Yuhuuddii Dimishaq joogtay isagoo caddaynaya inuu kanu
yahay Masiixa. 23 Oo markii maalmo badan dhaafeen, ayay
Yuhuuddu ku tashadeen inay dilaan; 24 laakiin Sawlos waa
ogaaday tashigoodii. Haddaba habeen iyo maalinba irdaha
magaalada bay ka fiirin jireen inay dilaan; 25 laakiin xertiisii
baa habeen qaadday oo derbiga ka sii daysay iyagoo dambiil
ku dejinaya. 26 Oo kolkuu Yeruusaalem yimid, wuxuu isku
dayay inuu xertii ku darsamo; dhammaantoodse waa ka
cabsadeen, maxaa yeelay, ma ay rumaysnayn inuu xer
yahay. 27 Laakiin Barnabas baa kaxeeyey, oo wuxuu u
geeyey rasuulladii oo u sheegay siduu Rabbiga ugu arkay
jidka, iyo inuu la hadlay, iyo siduu Dimishaq geesinimo ugu
wacdiyey magaca Ciise. 28 Markaasuu iyagii la joogay,
isagoo la gelaya, kalana baxaya Yeruusaalem, geesinimona
dadka ugu wacdiyaya magaca Rabbiga; 29 wuxuuna la
hadlay oo la dooday Yuhuuddii Gariigta ahayd; iyaguse
waxay doondooneen inay dilaan. 30 Kolkii walaalihii garteen,
waxay keeneen Kaysariya, oo waxay u sii direen Tarsos.
31 Sidaas darteed kiniisaddii ku tiil Yahuudiya iyo Galili iyo
Samaariya oo dhan nabad bay lahayd, waana dhisantay oo
badatay iyadoo ku socota cabsida Rabbiga iyo gargaarka
Ruuxa Quduuska ah. 32 Oo waxaa dhacay intuu Butros
marayay dhinacyada oo dhan inuu u yimid quduusiintii Ludda
degganayd. 33 Halkaasna wuxuu ka helay nin la odhan jiray
Ayne'as, kaas oo siddeed sannadood sariirtiisa jiifay, maxaa
yeelay, curyaan buu ahaa. 34 Markaasaa Butros wuxuu ku
yidhi, Ayne'asow, Ciise Masiix baa ku bogsiinaya; kac oo
sariirtaada gogol. Oo markiiba wuu kacay. 35 Kuwii Ludda
iyo Sharoon degganaana waa arkeen, oo Rabbigay u soo
jeesteen. 36 Haddaba waxaa Yaafaa joogi jirtay naag xer ah
oo la odhan jiray Tabita taasoo micneheedu yahay Dorkas.
Naagtaas waa camal wanaagsanayd, sadaqooyinna waa
bixin jirtay. 37 Wakhtigaas waxaa dhacday inay bukootay,
wayna dhimatay, kolkay maydheenna waxay dhigeen qollad
sare. 38 Dhowaantii ay Ludda u dhowayd Yaafaa aawadeed,
xertii markay maqleen in Butros halkaas joogo, waxay u
direen laba nin iyagoo ka baryaya oo leh, Ha ka raagin inaad
noo timaadid. 39 Markaasaa Butros kacay oo raacay iyagii.
Oo kolkuu yimidna, waxay geeyeen qolladdii sare; carmalladii
oo dhammina waa ag taagnaayeen iyagoo ooyaya oo
tusaya garbageliyaashii iyo dharkii Dorkas samaysay intay
la joogi jirtay iyaga. 40 Laakiin Butros baa dhammaantood
dibadda u saaray, markaasuu jilba joogsaday oo duceeyey,
oo intuu meydka xaggiisa u jeestay ayuu ku yidhi, Tabitay,
kac. Markaasay indhihii kala qaadday; oo markay Butros
aragtayna way fadhiisatay. 41 Markaasuu gacan siiyey oo
kiciyey; oo markuu u yeedhay quduusiintii iyo carmalladiiba,
iyadoo nool ayuu hor taagay. 42 Taasna waa laga wada
ogaaday Yaafaa oo dhan; kuwa badanna waa rumaysteen
Rabbiga. 43 Waxaana dhacday inuu maalmo badan Yaafaa
la joogay nin la yidhaahdo Simoon oo megdeeye ah.

**10** Haddaba waxaa Kaysariya joogay nin la odhan jiray
Korneeliyos, oo taliye u ahaa boqol askari oo la odhan
jiray Ciidankii Talyaaniga. 2 Ninkaasu nin cibaadaysan buu
ahaa, oo Ilaah buuna ka cabsan jiray, isaga iyo gurigiisuba,
dadkana sadaqooyin badan buu siin jiray, oo had iyo goorna
Ilaah buu baryi jiray. 3 Abbaaraha sagaalka saacadood oo
maalmeed wuxuu riyo bayaan ugu arkay malaa'igtii Ilaah oo
u soo gelaysa oo ku leh isaga, Korneeliyosow. 4 Markaasuu
aad u fiiriyey isagoo cabsanaya oo wuxuu ku yidhi, Waa
maxay, Rabbiyow? Markaasay ku tidhi, Baryooyinkaaga iyo
sadaqooyinkaaga waxay Ilaah hortiisa u baxeen xusuus. 5
Haddaba waxaad niman u dirtaa Yaafaa inay u soo yeedhaan
Simoon kan la yidhaahdo Butros. 6 Wuxuu marti u yahay
nin Simoon la yidhaahdo oo megdeeye ah oo gurigiisu ku
yaal badda dhinaceeda. 7 Oo kolkii malaa'igtii isaga la
hadashay ka tagtay, wuxuu u yeedhay laba midiidin iyo
askari cibaadaysan oo ka mid ah kuwa had iyo goorba
u adeegi jiray; 8 oo markuu wax walba u sheegay, ayuu
wuxuu u diray Yaafaa. 9 Haddaba maalintii dambe intay
safrayeen oo magaalada ku soo dhowaanayeen, ayaa Butros

wuxuu tegey gurigii dushiisa inuu ku tukado abbaaraha
saacaddii lixaad, 10 waana gaajooday oo wuxuu doonayay
inuu wax cuno; laakiin intay wax u diyaarinayeen ayuu
riyooday, 11 wuxuuna arkay samada oo furantay, oo waxaa
soo degayay weel sida shiraaq weyn oo kale oo afartiisa
geesood loogu soo dejinayo dhulka; 12 oo waxaana ku
jiray jinsi kasta oo xayawaan afar lugood leh iyo waxa
dhulka gurguurta iyo haadda cirka. 13 Oo waxaa isaga u
yimid cod leh, Kac, Butrosow; gowrac oo cun. 14 Laakiin
Butros wuxuu yidhi, Saas yaanay noqon, Rabbiyow, maxaa
yeelay, weligay ma aan cunin wax xaaraan ah oo aan
nadiif ahayn. 15 Mar labaad codkii baa u yimid isagoo leh,
Wixii Ilaah nadiifiyey, xaaraan ha ka dhigin. 16 Taasuna
waxay dhacday saddex goor; markiibana weelkii waa loo
qaaday samada. 17 Haddaba Butros intuu si aad ah ugu
wareersaday riyadii uu arkay waxay micneheedu ahayd, bal
eega, nimankii Korneeliyos soo diray, iyagoo mar weyddiistay
gurigii Simoon, ayay waxay istaageen albaabka hortiisa, 18
waxayna u yeedheen oo weyddiisteen in Simoon, kan la
yidhaahdo Butros, uu meeshaas marti ku yahay iyo in kale.
19 Oo Butros intuu riyadii ka fikirayay ayaa Ruuxu wuxuu ku
yidhi, Bal eeg, saddex nin baa ku raadinaysa. 20 Haddaba
kac oo hoosta tag oo raac, adoo aan shaki lahayn, maxaa
yeelay, anaa soo diray. 21 Markaasaa Butros nimankii hoos
ugu tegey, oo wuxuu ku yidhi, Bal eega, anigu waxaan ahay
kaad raadinaysaan. Waa maxay sababta aad u timaadeen?
22 Markaasay waxay ku yidhaahdeen, Korneeliyos oo boqol
askari u taliya oo nin xaqa ah, Ilaahna ka cabsada, oo
quruunta Yuhuudda oo dhammuna wanaaggiisa u markhaati
furto, waxaa u digay isaga malaa'ig quduus ah inuu gurigiisa
kuugu yeedho, hadallona kaa maqlo. 23 Sidaas aawadeed
ayuu gudaha ugu yeedhay oo marti geliyey. Maalintii dambe
ayuu kacay oo iyagii la baxay, walaalihii Yaafaa joogana
qaarkood ayaa raacay isagii. 24 Maalintii dambe waxay soo
galeen Kaysariya. Korneeliyosna iyaguu sugayay isagoo
isugu yeedhay xigtadiisii iyo saaxiibbadiisii u dhowaa. 25
Markuu Butros soo galay, ayaa Korneeliyos ka hor yimid,
lugihiisana ku dhacay, waana caabuday. 26 Laakiin Butros
baa kiciyey oo ku yidhi, Istaag; aniga qudhayduba nin baan
ahay. 27 Oo intuu isagii la hadlayay, ayuu soo galay, oo
wuxuuna arkay kuwo badan oo isu yimid; 28 markaasuu ku
yidhi iyagii, Idinka qudhiinnu waa og tihiin inay xaaraan u
tahay nin Yahuudi ah inuu ku darmado ama u dhowaado nin
quruun kale ah; hase ahaatee Ilaah baa i tusay inaanan
ninna ku sheegin nin xaaraan ah ama aan nadiif ahayn;
29 sidaas aawadeed, markii la ii yeedhay, waxaan imid
diididla'aan. Saas darteed waxaan idin weyddiinayaa sababtii
aad iigu soo yeedheen. 30 Markaasaa Korneeliyos wuxuu ku
yidhi, Afar maalmood oo hore, saacaddan oo kale, ayaan
joogay anoo gurigayga saacaddii sagaalaad ku tukanaya; oo
bal eeg waxaa i hor istaagay nin qaba dhar dhalaalaya, 31
oo wuxuu yidhi, Korneeliyosow, baryadaadii waa la maqlay,
sadaqooyinkaagiina Ilaah hortiisa waa laga xusuustay. 32
Sidaas darteed Yaafaa cid u dir oo u yeedho Simoon,
kan Butros la yidhaahdo. Wuxuu marti ku yahay guriga
Simoon megdeeye oo badda dhinaceeda yaal. 33 Sidaas
darteed markiiba cid baan kuu soo diray; oo si wanaagsan
baadna u samaysay inaad timid. Haddaba sidaa darteed
dhammaantayo halkan waa wada joognaa Ilaah hortiisa,
inaannu maqalno waxyaalihii Rabbigu kugu amray oo dhan.
34 Markaasaa Butros afkiisa kala qaaday oo wuxuu yidhi,
Runtii waxaan garanayaa Ilaah inuusan dadka u kala eexan:
35 laakiin kii kastoo Ilaah ka cabsada, xaqnimadana sameeya,
quruun kastaba ha ku jiree, Ilaah waa aqbalaa. 36 Ereygii
ayuu u soo diray reer binu Israa'iil isagoo ku wacdiyaya
nabad xagga Ciise Masiix. Isagu waa wax walba Rabbigood.
37 Idinka qudhiinnu waad taqaaniin ereygaas lagu faafiyey
Yahuudiya oo dhan oo laga soo bilaabay Galili, baabtiiskii
Yooxanaa ku wacdiyey dabadeed, 38 iyo siduu Ilaah Ciisaha
reer Naasared ku subkay Ruuxa Quduuska ah iyo xoogga.
Isagu waa wareegi jiray, wanaagna wuu fali jiray, oo wuxuu
bogsiin jiray kuwii Ibliisku caddibay oo dhan; maxaa yeelay,
Ilaah baa la jiray isagii. 39 Annagu markhaatiyaal baannu ka
nahay waxyaalihii oo dhan oo uu ku sameeyey waddanka
Yuhuudda iyo Yeruusaalem labadaba. Isaguna waa kii ay
dileen markay geedkii ka soo deldeleen. 40 Isaga Ilaah baa
maalintii saddexaad sara kiciyey, oo bayaan u muujiyey,
41 uma muujin dadka oo dhan, laakiin wuxuu u muujiyey
markhaatiyaashii Ilaah hore u doortay, xataa annaga oo isaga
wax la cunnay oo la cabnay markuu kuwii dhintay ka soo
sara kacay dabadeed. 42 Wuxuu nagu amray inaannu dadka
wacdinno, aannuna markhaati u furno inuu kanu yahay kii
Ilaah ka dhigay xaakinka kuwa nool iyo kuwa dhintayba.
43 Isaga nebiyada oo dhan ayaa u markhaati fura in mid
kastoo isaga rumaystaa uu magiciisa ku helo dembidhaafka.
44 Intii Butros weli ku hadlayay hadalladaas ayaa Ruuxa
Quduuska ah ku soo degay kuwa ereyga maqlay oo dhan.
45 Oo kuwii ka mid ahaa kuwii gudnaa oo rumaystay, iyagoo
ahaa intii Butros la timid, way wada yaabeen, maxaa yeelay,
xataa dadka aan Yuhuudda ahayn ayaa lagu soo shubay
hadiyadda Ruuxa Quduuska ah. 46 Waayo, waxay maqleen
iyagoo afaf ku hadlaya oo Ilaah weynaynaya. 47 Markaasaa
Butros u jawaabay, oo ku yidhi, Ma nin baa biyaha diidi kara,
si aan loogu baabtiisin kuwaas oo ah kuwa Ruuxa Quduuska

ah helay sidaannu annaguna u helnay? 48 Markaasuu ku
amray in lagu baabtiiso magaca Ciise Masiix. Kolkaasay ka
baryeen inuu dhawr maalmood la joogo.

11 Haddaba rasuulladii iyo walaalihii Yahuudiya joogay
ayay waxay maqleen in dadka aan Yuhuudda ahaynna
ay ereygii Ilaah aqbaleen. 2 Oo markii Butros Yeruusaalem
yimid, kuwii ka mid ahaa kuwii gudnaa ayaa la murmay
isagii, 3 oo waxay ku yidhaahdeen, Waxaad u tagtay niman
aan la gudin, waadna la cuntay. 4 Laakiin Butros wuxuu
bilaabay inuu sheekadii ugu sheego siday isugu xigtay, oo
wuxuu yidhi. 5 Anigu waxaan joogay magaalada Yaafaa la
yidhaahdo oo waan tukanayay, markaas waxaan khilaawo
ku arkay riyo oo ahayd weel soo degaya sida shiraaq
weyn oo kale oo afartiisa geesood samada lagaga soo
dejinayo; wuuna ii soo dhowaaday, 6 oo markaan aad u
fiiriyey, ayaan ka fikiray oo waxaan arkay xayawaankii afarta
lugood lahaa oo dhulka, iyo dugaagta, iyo waxa gurguurta,
iyo haadda cirka. 7 Oo waxaan maqlay cod igu leh, Kac,
Butrosow, gowrac oo cun. 8 Laakiin waxaan idhi, Saas
yaanay noqon, Rabbiyow, maxaa yeelay, wax xaaraan ah
oo aan nadiif ahayn, weligay afkayga ma gelin. 9 Laakiin
markii labaad cod baa samada ka soo jawaabay oo yidhi,
Wixii Ilaah nadiifiyey, xaaraan ha ka dhigin. 10 Taasna
waxay dhacday saddex goor; markaasaa dhammaantood
mar labaad samada kor loogu bixiyey. 11 Oo bal eega,
markiiba saddex nin baa istaagtay gurigaannu joognay
hortiisa, kuwaasoo la iiga soo diray Kaysariya. 12 Ruuxuna
wuxuu ii sheegay inaan raaco iyaga, anoo aan shaki lahayn.
Oo lixdatan walaalaha ihina way i raaceen; waxaannan
galnay ninkii gurigiisii; 13 markaasuu wuxuu noo sheegay
siduu gurigiisa ugu arkay malaa'igta taagan oo ku leh, Yaafaa
cid u dir oo uga soo yeedh Simoon kan la yidhaahdo Butros;
14 kaasoo kugula hadli doona hadallo aad ku badbaadi
doontid, adiga iyo dadka gurigaaga oo dhammiba. 15 Oo
kolkaan bilaabay inaan hadlo ayaa Ruuxa Quduuska ah ku
soo degay iyaga siduu bilowgii inoogu soo degay innagana.
16 Markaasaan xusuustay ereygii Rabbiga, siduu u yidhi,
Runtii Yooxanaa wuxuu dadka ku baabtiisay biyo; laakiin
idinka waxaa laydinku baabtiisi doonaa Ruuxa Quduuska ah.
17 Haddaba haddii Ilaah iyaga siiyey isku hadiyaddii, siduu
inoo siiyey markii aynu Rabbi Ciise Masiix rumaysannay,
anigu kumaan ahaa kaygan Ilaah diidi karaa? 18 Oo markay
waxyaalahaas maqleen, ayay dooddii ka aamuseen, Ilaah
bayna ammaaneen, oo waxay yidhaahdeen, Haddaba xataa
dadka aan Yuhuudda ahaynna Ilaah baa siiyey toobadkeen
inay nolol helaan. 19 Haddaba kuwii u kala firidhsanaa,
dhibaatadii kacday Istefanos aawadiis, waxay u sodcaaleen
tan iyo Foynike iyo Qubrus iyo Antiyokh, iyagoo aan ereyga
kula hadlin ninna, Yuhuudda oo keliya mooyaane. 20 Laakiin
waxaa jiray qaar iyaga ka mid ah oo ahaa niman reer
Qubrus iyo reer Kuranaya ahaa, kuwaasoo, kolkay Antiyokh
yimaadeen, xataa Gariiggiina la hadlay, iyagoo ku wacdiyaya
Rabbi Ciise. 21 Gacanta Rabbiguna waa la jirtay iyaga; oo
kuwa tiro badan oo rumaystay baa Rabbiga u soo jeestay.
22 Oo warkii iyaga ku saabsanaa baa wuxuu soo gaadhay
kiniisaddii Yeruusaalem ku tiil; markaasay Barnabas tan iyo
Antiyokh u direen; 23 kaasoo farxay markuu yimid oo arkay
nimcada Ilaah; wuxuuna kulligood ku waaniyey inay Rabbiga
ku xajistaan niyad qalbiga ka timid, 24 maxaa yeelay, nin
wanaagsan buu ahaa oo waxaa ka buuxsamay Ruuxa
Quduuska ah iyo rumaysad; dad badan baana Rabbiga u
kordhay. 25 Markaasuu Tarsos tegey inuu Sawlos ka doono;
26 markuu soo helayna, ayuu Antiyokh keenay. Waxaana
dhacday inay sannad dhan kiniisadda la urureen oo ay dad
badan wax bareen, oo meeshii ugu horraysay ee xertii loogu
yeedhay Masiixiyiin waxay ahayd Antiyokh. 27 Wakhtigaas
waxaa Yeruusaalem ka yimid nebiyo inay Antiyokh tagaan.
28 Markaasaa mid iyaga ka mid ah oo Agabos la odhan
jiray ayaa istaagay, oo wuxuu Ruuxa ku sheegay in abaar
weyni dunida ku dhici doonto, taas oo dhacday wakhtigii
Kalawdiyos. 29 Markaasaa mid kasta oo xertii ka mid ihiba,
sidii tabartiisu ahayd, wuxuu goostay inuu caawimaad u
diro walaalihii Yahuudiya jooga, 30 oo sidaasay yeeleen, oo
waxay waayeelladii ugu sii dhiibeen gacanta Barnabas iyo
Sawlos.

12 Haddaba wakhtigaas boqorkii Herodos ahaa ayuu
wuxuu gacmihiisa u fidiyey inuu dhibo qaar ka mid
ah kuwa kiniisadda. 2 Wuxuuna seef ku dilay Yacquub oo
ahaa Yooxanaa walaalkiis. 3 Oo markuu arkay inay ka
farxisay Yuhuuddii, ayuu weliba ku daray inuu soo qabto
Butros. Maalmahaasna waxay ahaayeen maalmihii Iidda
Kibista-aan-khamiirka-lahayn. 4 Oo kolkuu qabtayna, wuxuu
ku riday xabsi, oo u dhiibay afar kooxood oo afar askari
ah inay ilaaliyaan, isagoo doonaya inuu Iidda Kormaridda
dabadeed dadka u soo saaro. 5 Sidaas darteed Butros
xabsigaa lagu hayay; laakiin kiniisadda baa Ilaah aad iyo aad
ugu bariday isaga. 6 Oo markii Herodos damcay inuu soo
saaro, isla habeenkaas Butros wuxuu kala dhex hurday laba
askari isagoo ku xidhan laba silsiladood; waardiyayaalna
albaabka hortiisa ayay xabsiga ka ilaalinayeen. 7 Oo bal
eega, malaa'igtii Rabbiga baa is-ag taagtay, oo iftiin baana
xabsiga iftiimiyey. Markaasay Butros dhinaca ku dhufatay

oo toosisay, oo waxay ku tidhi, Dhaqso u kac. Kolkaasaa
silsiladihiina gacmihiisii ka dhaceen. 8 Markaasaa malaa'igtii
waxay ku tidhi, Gunto oo kabahaaga xidho. Taas buuna
yeelay. Markaasay waxay ku tidhi isagii, Dharkaagii huwo oo
i soo raac. 9 Markaasuu soo baxay oo raacay; ma uuna
garanaynin in waxay malaa'igtu samaysay ay run tahay,
laakiin wuxuu u maleeyey inuu riyo arkay. 10 Oo markay
dhaafeen waardiyihii kowaad iyo kii labaad ayay waxay
yimaadeen iriddii birta ahayd oo magaalada loo mari jiray;
taas oo iyagii isaga furantay; markaasay ka baxeen oo
waxay sii dhex mareen jid yar; markiiba malaa'igtii waa
ka tagtay isagii. 11 Oo markii Butros isgartay ayuu wuxuu
yidhi, Imminka run ahaantii waan garanayaa in Rabbigu
malaa'igtiisii soo diray oo iga bixiyey gacanta Herodos iyo
wixii dadka Yuhuuddu filanayeen oo dhan. 12 Kolkuu waxaas
ka fikiray, wuxuu yimid gurigii Maryan, oo ahayd hooyadii
Yooxanaa oo Markos la odhan jiray; meeshaasoo dad badan
ku urursanaayeen oo ku tukanayeen. 13 Markuu albaabka
iridda garaacayna, waxaa timid gabadh midiidin ah oo
Roda la odhan jiray inay maqasho. 14 Kolkay codkii Butros
garatay, farxad darteed bay albaabka u furi weyday, laakiin
gudaha bay ku orodday, wayna sheegtay in Butros iridda hor
taagan yahay. 15 Markaasay waxay ku yidhaahdeen iyadii,
Waad waalan tahay. Laakiin way ku sii adkaysatay inay
sidaa tahay. Iyaguse waxay yidhaahdeen, Waa malaa'igtiisii.
16 Laakiin Butros waa sii garaacay, oo kolkay albaabka
fureenna, way arkeen isagii, wayna yaabeen. 17 Laakiin
isagoo u gacan haadinaya inay aamusaan ayuu wuxuu u
sheegay sida Rabbigu xabsiga uga soo saaray. Wuxuuna ku
yidhi, Waxyaalahan u sheega Yacquub iyo walaalahaba.
Markaasuu ka tegey oo meel kale aaday. 18 Markii waagu
beryay, qasmid aan yarayn ayaa askartii ka dhex kacday
waxa Butros ku dhacay aawadeed. 19 Oo Herodos markuu
raadiyey isagii oo heli waayay, ayuu wuxuu imtixaamay
askartii, oo wuxuu ku amray in iyaga la laayo. Markaasuu
Yahuudiya ka tegey oo Kaysariya aaday, oo meeshaasuu
joogay. 20 Dadka Turos iyo Siidoon ayuu aad uga xumaaday;
markaasay u yimaadeen isagii iyagoo isku wada qalbi
ah, oo waxay la saaxiibeen Balaastos kii gurigii boqorka
u talin jiray, oo nabad bay ka baryeen, maxaa yeelay,
waddankooda waxaa cuntada siin jiray waddankii boqorka. 21
Maalintii la ballamay ayaa Herodos wuxuu gashaday dharkii
boqornimada oo carshiga ku fadhiistay, markaasuu iyaga
qudbad u jeediyey. 22 Dadkiina waa qayliyeen, oo waxay
yidhaahdeen, Kanu waa ilaah codkiis ee ma aha bini-aadan
codkiis. 23 Markiiba ayaa malaa'igtii Rabbigu ku dhufatay,
maxaa yeelay, Ilaah ma uu ammaanin; markaasaa waxaa
cunay dixiryo, oo naftiina ka dhacday. 24 Laakiin Rabbiga
ereygiisu waa kordhay oo batay. 25 Barnabas iyo Sawlos
ayaa ka soo noqday Yeruusaalem markay shuqulkoodii soo
dhammaysteen, oo waxay wateen Yooxanaa oo la odhan
jiray Markos.

**13** Haddaba kiniisaddii Antiyokh ku tiil waxaa joogay
nebiyo iyo macallimiin, kuwaas oo ahaa Barnabas,
iyo Simecoon oo la odhan jiray Niger, iyo Lukiyos oo reer
Kuranaya ah, iyo Mana'een oo la koray taliye Herodos,
iyo Sawlos. 2 Oo markay Rabbiga caabudayeen oo
soomanaayeen ayaa Ruuxa Quduuska ahu wuxuu ku yidhi,
Barnabas iyo Sawlos iigu sooca shuqulkii aan ugu yeedhay.
3 Markay soomeen oo duceeyeen oo gacmahoodii saareen
dabadeed ayay direen iyagii. 4 Haddaba iyagoo Ruuxa
Quduuska ahu soo diray waxay tageen Selukiya; meeshaasna
waxay uga dhoofeen Qubrus. 5 Oo kolkay Salamis joogeen,
ereygii Ilaah bay ku wacdiyeen sunagogyada Yuhuudda; oo
Yooxanaa ayay kaaliye u haysteen. 6 Oo kolkay gasiiraddii
oo dhan dhex mareen ayay waxay yimaadeen Bafos, taas
oo ay kala kulmeen nin saaxir ah oo ahaa nebi been ah
oo Yuhuudi ah oo magiciisa la odhan jiray Barciise; 7 kaas
oo la jiray taliye Sergiyos Bawlos oo ahaa nin garasha leh.
Kaasu markuu u yeedhay Barnabas iyo Sawlos, wuxuu
doonayay inuu ereyga Ilaah maqlo. 8 Laakiin waxaa iyagii
ka hor istaagay saaxirka Elumas (oo sidaas magiciisa loo
fasiri jiray), oo wuxuu isku dayayay inuu taliyihii ka leexiyo
iimaanka. 9 Laakiin Sawlos, oo ahaa Bawlos, kaasoo Ruuxa
Quduuska ahu ka buuxsamay, ayaa aad u fiiriyey, 10 oo
ku yidhi, Kaaga khiyaanada iyo xumaanta oo dhammu ka
buuxsantay oo ah wiilka Ibliiska iyo cadowga xaqnimada
oo dhan, miyaanad ka joogsanayn qalloocinta aad ku
qalloocinaysid jidadka toosan oo Rabbiga? 11 Haddaba, bal
eeg, gacanta Rabbigu waa ku saaran tahay, oo waad indha
beeli doontaa, adigoo aan qorraxda arkayn intii wakhti ah.
Kolkaasaa markiiba waxaa ku soo dhacday isagii ceeryaamo
iyo gudcur; wuuna warwareegay oo doondoonay nin gacanta
ku haga. 12 Kolkaasaa taliyihii, kolkuu arkay wixii dhacay,
rumaystay, isagoo ka yaabsan Rabbiga waxbariddiisa. 13
Haddaba Bawlos iyo kuwii la socday ayaa ka dhoofay
Bafos, oo waxay yimaadeen Berga oo Bamfuliya ku jirta;
markaasaa Yooxanaa ka tegey iyagii oo Yeruusaalem
ku noqday. 14 Laakiin iyagu kolkii ay ka tageen Berga
waxay yimaadeen Antiyokh oo Bisidiya ku jirta; oo maalintii
sabtidana sunagogga ayay galeen oo fadhiisteen. 15 Markii
sharcigii iyo nebiyadii la akhriyey dabadeed kuwii sunagogga
u sarreeyey ayaa cid u soo diray iyagoo leh, Walaalayaalow,

haddaad dadka u haysaan hadal waana ah, dhaha. 16
Markaasaa Bawlos istaagay isagoo gacan haadinaya, oo
wuxuu yidhi. Nimanka reer binu Israa'iilow iyo kuwiinna Ilaah
ka cabsadow, dhegaysta. 17 Ilaaha dadkan reer binu Israa'iil
wuxuu doortay awowayaasheen, dadkana buu sarraysiiyey
markay dhulka Masar degganaayeen, oo gacan taagan
buuna kaga soo saaray iyagii. 18 Oo wakhti abbaaraha
afartan sannadood ah ayuu dabiicaddoodii ugu dulqaatay
cidlada. 19 Oo markuu toddoba quruumood ka baabbi'iyey
dhulka Kancaan dabadeed ayuu dhulkoodii dhaxal u siiyey
iyagii abbaaraha afar boqol iyo konton sannadood; 20
waxyaalahaas dabadeedna wuxuu siiyey xaakinno ilaa
nebi Samuu'eel. 21 Dabadeed waxay weyddiisteen boqor,
markaasaa Ilaah wuxuu iyagii siiyey Saa'uul ina Qiish
oo ahaa nin reer Benyaamiin intii afartan sannadood ah.
22 Kolkuu isagii boqortooyadii ka wareejiyeyna, wuxuu u
kiciyey iyagii Daa'uud inuu boqorkooda noqdo; kaasoo uu u
markhaati furay isagoo leh, Waxaan ogaaday Daa'uud oo
ina Yesay ah inuu yahay nin ah sida qalbigaygu doonayo
oo samayn doona waxaan doonayo oo dhan. 23 Ninkan
farcankiisii Ilaah siduu ballanqaaday ayuu Israa'iil ugaga
keenay Badbaadiye kaasoo ah Ciise; 24 oo intuusan imanba,
Yooxanaa wuxuu dadka Israa'iil oo dhan hore ugu wacdiyey
baabtiiska toobadda. 25 Oo intii Yooxanaa shuqulkiisa
dhammaynayay, wuxuu yidhi, Yaad u malaynaysaan inaan
ahay? Anigu isagii ma ihi. Laakiin, bal eega, waxaa iga daba
imanaya mid aanan istaahilin inaan kabaha cagihiisa ka
furo. 26 Walaalayaalow, idinkoo ah farcankii Ibraahim iyo
kuwa idinku dhex jira oo Ilaah ka cabsadow, innaga ayaa
laynoo soo diray ereyga badbaadintan. 27 Waayo, kuwii
Yeruusaalem joogay iyo taliyayaashoodii waa garan waayeen
isaga iyo codadkii nebiyada oo sabti walba la akhriyi jiray,
sidaas daraaddeed ayay waxyaalihii dhammeeyeen markay
xukumeen isagii. 28 Oo in kastoo ayan ka helin sabab lagu
dilo, ayay waxay Bilaatos weyddiisteen in la dilo. 29 Oo
markay dhammeeyeen waxyaalihii laga qoray oo dhan, ayay
geedkii ka soo dejiyeen oo xabaal geliyeen. 30 Laakiin Ilaah
baa ka sara kiciyey kuwii dhintay, 31 oo maalmo badan
waxaa isagii arkay kuwii kala yimid Galili ilaa Yeruusaalem
kuwaasoo hadda ah markhaati furayaashiisii xagga dadka.
32 Oo waxaannu idin keenaynaa war wanaagsan oo ku
saabsan ballankii awowayaasheen loo ballanqaaday, 33
oo ah sidii Ilaah ballankaas ugu oofiyey carruurteenna
markuu Ciise sara kiciyey, sida ay Sabuurka labaadna ugu
qoran tahay. Waxaad tahay Wiilkayga, maantaan ku dhalay.
34 Isagii buu ka sara kiciyey kuwii dhintay inuusan mar
dambe qudhun ku noqon, sidaas daraaddeed ayuu sidan ku
hadlay, isagoo leh, Waxaan idin siin doonaa barakooyinka
runta ah oo Daa'uud loo ballanqaaday. 35 Saas aawadeed
wuxuu Sabuur kale ku yidhi, Kaaga quduuska ah uma
oggolaan doontid inuu qudhmo. 36 Maxaa yeelay, Daa'uud
markuu qarnigiisa ugu shaqeeyey talada Ilaah dabadeed
ayuu dhintay, waana lala xabaalay awowayaashiis, wuuna
qudhmay; 37 laakiin kii Ilaah sara kiciyey, ma uu qudhmin.
38 Sidaas darteed, walaalayaalow, garta in ninkan xaggiisa
dembidhaafka laydinkaga wacdiyey; 39 nin kasta oo isaga
rumaystana xaq baa lagaga dhigay wax walba oo sharciga
Muuse uusan xaq idinkaga dhigi karin. 40 Sidaas darteed
iska jira inaanay idinku dhicin wixii nebiyadu sheegeen
iyagoo leh, 41 Bal eega, kuwiinnan wax quudhsadow,
yaaba oo luma; Waayo, maalmihiinnii waxaan samaynayaa
shuqul, Oo ah shuqul aydnaan rumaysan doonin, haddii
laydiin sheego. 42 Kolkay baxayeen, dadkii waxay ka
baryeen inay hadalladaas sabtida dambe kula hadlaan. 43
Haddaba markii sunagogga laga tegey, kuwa badan oo
Yuhuud ah iyo kuwa cibaadaysan oo Yuhuudda raacsan
ayaa waxay raaceen Bawlos iyo Barnabas, kuwaas oo la
hadlayay iyaga oo ku adkeeyey inay nimcada Ilaah ku sii
wadaan. 44 Sabtida dambe ayaa magaaladii oo dhan in
yar mooyaane isugu timid inay maqasho ereyga Ilaah. 45
Laakiin Yuhuuddu markay arkeen dadkii faraha badnaa,
waxaa iyaga ka buuxsamay masayr, wayna beeneeyeen
waxyaalihii Bawlos ku' hadlay, waana caayeen. 46 Haddaba
Bawlos iyo Barnabas ayaa geesinimo ku hadlay iyagoo leh,
Waxay ahayd lagama maarmaan in ereyga Ilaah markii hore
idinka laydinkula hadlo. Laakiin idinku waad diiddeen, oo
waxaad isku xukunteen sidii kuwo aan istaahilin nolosha
weligeed ah, oo bal eega, sidaas aawadeed waxaannu
u jeesanaynaa dadka aan Yuhuudda ahayn. **(aiōnios g166)**
47 Maxaa yeelay, sidaasaa Rabbigu nagu amray isagoo
leh, Waxaan kaa dhigi doonaa iftiinka quruumaha, Inaad
badbaadinta u noqotid ilaa meeshii dunida ugu fog. 48
Haddaba markii dadkii aan Yuhuudda ahayn taas maqleen,
ayay ku farxeen oo ereygii Ilaah ammaaneen; oo waxaana
rumaystay kuwii nolosha weligeed ah loo dhigay. **(aiōnios
g166)** 49 Ereygii Rabbigana waxaa lagu faafiyey waddankii
oo dhan. 50 Laakiin Yuhuuddu waxay soo kiciyeen dumarkii
cibaadada iyo sharafta lahaa iyo raggii madaxda magaalada
ahaa, silec bayna Bawlos iyo Barnabas ku kiciyeen, oo
soohdintoodii bay ka eryeen iyagii. 51 Laakiin markay siigadii
cagahooda ka dhabaandhabeen, dabadeed ayay waxay
yimaadeen Ikoniyon. 52 Xertiina waxaa ka buuxsamay farxad
iyo Ruuxa Quduuska ah.

**14** Waxaa Ikoniyon ka dhacday inay wada galeen
sunagogga Yuhuudda, oo siday u hadleen aawadeed
dad badan oo Yuhuud iyo Gariigba ah ayaa rumaystay.
**2** Laakiin Yuhuuddii caasiyiinta ahayd ayaa waxay dadkii
aan Yuhuudda ahayn ku kiciyeen oo si xun ugu direen
walaalihii. **3** Haddaba wakhti dheer ayay halkaas joogeen
iyagoo geesinimo ugu hadlaya Rabbiga, kaasoo markhaati u
furay ereyga nimcadiisa, wuxuuna siiyey inay calaamooyin
iyo yaabab gacmahooda ku sameeyaan. **4** Markaasaa dadkii
badnaa oo magaaladu kala qaybsameen, oo qaar waxay
raaceen Yuhuudda, qaarna rasuulladii. **5** Markii dadkii aan
Yuhuudda ahayn iyo Yuhuuddaba, iyaga iyo taliyayaashoodii,
ay ku yaaceen inay caayaan oo dhagxiyaan, **6** ayay
garteen, oo waxay u carareen magaalooyinkii la odhan jiray
Luka'oniya iyo Lustara iyo Derbe iyo dhulka ku wareegsan;
**7** meeshaasna ayay injiilka ku wacdiyeen dadka. **8** Lustara
waxaa fadhiyey nin aan cagaha xoog ku lahayn, oo tan iyo
markuu uurka hooyadii ka dhashay curyaan ahaa, kaasoo
aan weligiis socon. **9** Isagu wuxuu maqlay Bawlos oo hadlaya,
kaasoo indhaha aad ugu fiiriyey, gartayna inuu rumaysad uu
ku bogsan karo leeyahay, **10** wuxuuna cod dheer ku yidhi,
Cagahaaga sare isugu taag. Markaasuu booday oo socday.
**11** Markii dadkii badnaa arkeen wixii Bawlos sameeyey, ayay
codkoodii sare u qaadeen, iyagoo afkii Luka'oniya ku leh,
Ilaahyadu waxay inoogu yimaadeen iyagoo sidii niman u
eg. **12** Barnabasna waxay u bixiyeen Yubiter; Bawlosna
waxay u bixiyeen Merkuriyos, maxaa yeelay, wuxuu ahaa
kii hadalka waday. **13** Markaasaa wadaadkii Yubiter oo
macbudkiisu ku yiil magaalada horteeda, wuxuu irdaha
keenay dibiyo, iyo ubaxyo isku taxan, wuxuuna doonayay
inuu dadkii badnaa la sadqeeyo. **14** Laakiin rasuulladii
Barnabas iyo Bawlos markay maqleen, ayay dharkoodii
jeexjeexeen, oo dadkii badnaa ku soo dhex boodeen,
iyagoo ku dhawaaqaya **15** oo leh, Niman yahow, maxaad
waxyaalahan u samaynaysaan? Annagu waxaannu nahay
niman idinla dabiicad ah, oo waxaannu idiin keenaynaa
war wanaagsan inaad ka soo jeesataan waxyaalahan
aan micnaha lahayn oo u jeesataan Ilaaha nool, kaasoo
sameeyey samada iyo dhulka iyo badda iyo waxyaalaha
ku jira oo dhan, **16** kaasoo qarniyada tegey quruumaha oo
dhan u oggolaaday inay jidadkooda ku socdaan. **17** Hase
ahaatee isu maragfurla'aan iskama sii dayn, laakiin wanaag
buu sameeyey, oo wuxuu samada idinka siiyey roob iyo
xilliyo barwaaqo ah, isagoo qalbiyadiinna ka dherginaya
cunto iyo farxad. **18** Markay waxyaalahaas yidhaahdeen,
ayay dadkii badnaa dhib kaga joojiyeen inay u sadqeeyaan
iyaga. **19** Laakiin waxaa Antiyokh iyo Ikoniyon ka yimid
Yuhuud, oo markay dadkii badnaa yeelsiiyeen, ayay Bawlos
dhagxiyeen, oo magaaladii ka jiideen, iyagoo u malaynaya
inuu dhintay. **20** Laakiin intii xertii hareerihiisii taagnaayeen,
ayuu kacay, markaasuu magaaladii galay; maalintii dambena
wuu ka baxay oo Barnabas u raacay Derbe. **21** Oo markay
magaaladaas injiilkii ku wacdiyeen oo kuwo badan xer
ka dhigeen, ayay ku noqdeen Lustara iyo Ikoniyon iyo
Antiyokh, **22** iyagoo nafihii xerta ku xoogaynaya, kuna
waaninaya inay iimaanka ku sii wadaan, iyagoo ku leh,
Waa inaynu dhibaatooyin badan ku galnaa boqortooyada
Ilaah. **23** Oo markay iyagii kiniisad walba waayeello uga
dooreen oo ay soon ku tukadeen, waxay iyagii ku ammaana
geliyeen Rabbiga ay rumaysteen. **24** Markaasay sii dhex
mareen Bisidiya oo yimaadeen Bamfuliya. **25** Oo kolkay
ereyga kaga hadleen Berga ayay waxay tageen Ataliya;
**26** meeshaasna waxay uga dhoofeen Antiyokh, taasoo
ahayd meeshii iyaga lagaga ammaana geliyey nimcadii
Ilaah shuqulkii ay sameeyeen aawadiis. **27** Oo markay
yimaadeen oo kiniisaddii isu ururiyeen waxay uga warrameen
waxyaalihii Ilaah iyaga la sameeyey oo dhan iyo siduu
albaabka iimaanka ugu furay dadkii aan Yuhuudda ahayn.
**28** Markaasay wakhti aan yarayn xertii la joogeen.

**15** Niman Yahuudiya ka yimid ayaa walaalihii wax baray
iyagoo leh, Haddaan caadada Muuse laydinku gudin,
badbaadi kari maysaan. **2** Oo markii Bawlos iyo Barnabas
wax aan yarayn kula murmeen oo ku su'aaleen iyaga,
ayaa walaalihii waxay doorteen Bawlos iyo Barnabas iyo
kuwo kale oo iyaga ka mid ah inay Yeruusaalem aadaan
oo ay u tagaan rasuulladii iyo waayeelladii inay su'aashan
kala hadlaan. **3** Sidaas daraaddeed iyagoo kiniisaddu soo
sagootiday, waxay sii dhex mareen Foynike iyo Samaariya,
iyagoo ka warramaya sidii dadkii aan Yuhuudda ahayn u soo
jeesteen; waxayna aad uga farxiyeen walaalihii oo dhan. **4**
Oo markay Yeruusaalem yimaadeen, ayaa kiniisaddii iyo
rasuulladii iyo waayeelladiiba soo dhoweeyeen, markaasay
waxay uga warrameen waxyaalihii Ilaah iyaga la sameeyey
oo dhan. **5** Laakiin waxaa kacay kuwo dariiqadii Farrisiinta
ahaa oo rumaysnaa, kuwaasoo leh, Waa in la gudo iyaga,
oo lagu amro inay sharciga Muuse xajiyaan. **6** Haddaba
rasuulladii iyo waayeelladii baa ururay inay xaajadan ka
tashadaan. **7** Oo kolkay wax badan su'aaleenna, Butros baa
istaagay oo ku yidhi iyagii, Walaalayaalow, waad og tihiin
in maalmo hore Ilaah dhexdiinna ka doortay in dadka aan
Yuhuudda ahayn ay afkayga ereygii injiilka ka maqlaan oo
ay rumaystaan. **8** Oo Ilaaha qalbiga garta ayaa u markhaati
furay iyaga, wuxuuna iyaga siiyey Ruuxa Quduuska ah siduu

innagana inoo siiyey; 9 oo inama kala soocin innaga iyo
iyaga, laakiin qalbiyadooda rumaysad buu ku nadiifiyey.
10 Haddaba maxaad Ilaah u jirrabaysaan inaad harqood
qoorta xerta saartaan, kaasoo innaga iyo awowayaasheen
aynaan qaadi karin? 11 Laakiin waxaan rumaysan nahay
inaynu ku badbaadi doonno nimcadii Rabbi Ciise siday ugu
badbaadi doonaan. 12 Dadkii badnaa oo dhammu way
wada aamuseen; wayna dhegaysteen Barnabas iyo Bawlos
markay uga warramayeen intay ahaayeen calaamooyinkii
iyo yaababkii Ilaah gacantooda ku sameeyey dadka aan
Yuhuudda ahayn dhexdooda. 13 Kolkay aamuseen dabadeed
ayaa Yacquub u jawaabay, isagoo leh, 14 Walaalayaalow, i
dhegaysta, Simecoon waa ka warramay sidii Ilaah markii
ugu horraysay u soo booqday dadka aan Yuhuudda ahayn
inuu dad uga soo bixiyo iyaga magiciisa aawadiis. 15
Taasuna waxay raacsan tahay hadalladii nebiyada; siday ugu
qoran tahay, 16 Waxyaalahaas dabadeed waan soo noqon
doonaa, Oo mar labaad ayaan dhisi doonaa taambuuggii
Daa'uud oo dhacay; Oo mar labaad ayaan dhisi doonaa
jajabkiisa, Waanan taagi doonaa; 17 Si nimankii hadhay
ay Rabbiga u doondoonaan, Iyo quruumaha oo dhan oo
magacayga loogu yeedho, 18 Taas waxaa yidhi Rabbiga
waxyaalahaas muujiyey tan iyo bilowgii dunida. (aiōn g165) 19
Sidaas daraaddeed taladaydu waxay tahay inaynaan dhibin
kuwa ka mid ah dadka aan Yuhuudda ahayn oo Ilaah u
jeestay; 20 laakiin inaynu u qorno iyagii inay ka fogaadaan
wasakhnimada sanamyada, iyo sinada, iyo waxa la ceejiyo,
iyo dhiigga. 21 Maxaa yeelay, tan iyo qarniyadii hore waxaa
Muuse magaalo walba ku leeyahay kuwa dadka ku wacdiya
waxa isaga ku saabsan, oo sabti walba sunagogyadaa
laga akhriyaa. 22 Kolkaasay la wanaagsanaatay rasuulladii
iyo waayeelladii iyo kiniisaddii oo dhan inay iska dhex
doortaan niman ay Antiyokh ula diraan Bawlos iyo Barnabas,
kuwaas oo ahaa Yuudas oo la odhan jiray Barsabaas iyo
Silas oo ahaa niman madax ah walaalaha dhexdooda. 23
Markaasay qoreen oo iyagii la direen warqad leh, Annagoo
ah rasuullada iyo walaalaha waayeellada ah waxaannu soo
salaamaynaa walaalaha ka mid ah dadka aan Yuhuudda
ahayn oo jooga Antiyokh iyo Suuriya iyo Kilikiya. 24
Waxaannu maqallay in kuwo annaga naga tegey hadallo
idinku dhibeen, nafihiinnana rogayeen, kuwaasoo aannan u
amrin; 25 sidaas daraaddeed waxaa nala wanaagsanaatay,
annagoo isku qalbi noqonnay, inaannu soo dooranno niman
aannu idiinla soo dirno gacaliyayaashayadii Barnabas iyo
Bawlos, 26 kuwaasoo ah niman naftooda u biimeeyey
magicii Rabbigeenna Ciise Masiix aawadiis. 27 Sidaas
aawadeed waxaannu soo dirnay Yuudas iyo Silas kuwaasoo
iyaguna afka idiinka sheegi doona waxyaalahaas oo kale.
28 Waxaa la wanaagsanaatay Ruuxa Quduuska ah iyo
annagaba inaannan idin saarin culaab ka weyn waxyaalahan
waajibka ah. 29 Waa inaad ka fogaataan waxa sanamyada
loo sadqeeyo, iyo dhiig, iyo waxa la ceejiyo, iyo sinada.
Kuwaas haddaad iska dhawrtaan si wanaagsan baad yeeli
doontaan. Nabadgelyo. 30 Sidaas daraaddeed, kolkii la diray
ayay waxay yimaadeen Antiyokh; oo markay dadkii badnaa
isu ururiyeen dabadeed waxay u dhiibeen warqaddii. 31
Markay akhriyeenna ayay waanadii ku farxeen. 32 Yuudas
iyo Silas, iyagoo qudhooduna nebiyo ahaa, ayay hadallo
badan walaalihii ku waaniyeen oo ku xoogeeyeen. 33 Oo
markay muddo joogeen dabadeed ayaa walaalihii nabad
ugu direen kuwii iyagii u soo diray. 34 Laakiin waxaa Silas la
wanaagsanaatay inuu meeshaas sii joogo. 35 Laakiin Bawlos
iyo Barnabas ayaa Antiyokh sii joogay, oo waxay kuwo badan
oo kale la barayeen oo kula wacdiyeyeen ereyga Rabbiga.
36 Maalmo dabadeed Bawlos ayaa wuxuu Barnabas ku yidhi,
Hadda aynu ku noqonno oo booqanno walaalaha jooga
magaalo kasta oo aynu ereyga Rabbiga ku wacdinnay inaan
soo aragno siday yihiin. 37 Barnabas wuxuu doonayay inay
kaxaystaan Yooxanaa oo la odhan jiray Markos. 38 Laakiin
Bawlos waxaa la wanaagsanaatay inayan kaxaysan isaga
kaasoo iyaga kaga tegey Bamfuliya oo aan shuqulkii iyaga u
raacin. 39 Waxaa dhacay khilaaf weyn; sidaas daraaddeed
way kala tageen, markaasaa Barnabas kaxaystay Markos,
oo wuxuu u dhoofay Qubrus; 40 laakiin Bawlos wuxuu
doortay Silas, markaasuu baxay isagoo ay walaalihii ku
ammaana gelinayaan nimcadii Ilaah. 41 Oo wuxuu dhex
maray Suuriya iyo Kilikiya isagoo kiniisadihii xoogaynaya.

**16** Oo wuxuu kaloo yimid Derbe iyo Lustara; oo bal
eega, halkaas waxaa joogay nin xer ah oo la odhan
jiray Timoteyos, oo ahaa Yahuudiyad rumaysan wiilkeed,
aabbihiise wuxuu ahaa Gariig. 2 Isagana walaalihii Lustara
iyo Ikoniyon joogay baa u marag furay. 3 Bawlos wuxuu
doonayay inuu isagu raaco; markaasuu waday oo guday,
Yuhuudda meelahaas joogtay darteed; maxaa yeelay,
kulligood way wada ogaayeen in aabbihiis uu Gariig
ahaa. 4 Oo intay magaalooyinka dhex marayeen, waxay u
dhiibeen amarradii rasuulladii iyo waayeelladii Yeruusaalem
joogay soo amreen, inay dhawraan. 5 Haddaba kiniisadihii
iimaankay ku xoogoobeen, oo maalin kastaba tiradoodu
waa kordhaysay. 6 Markaasay waxay dhex mareen dhulka
Farugiya iyo Galatiya iyagoo Ruuxa Quduuska ahu u diiday
inay ereyga kaga dhex hadlaan Aasiya, 7 oo markay
Musiya u dhowaadeen waxay isku dayeen inay Bituniya

galaan; laakiin Ruuxa Ciise uma oggolaan; 8 markaasay
soo dhaafeen Musiya oo waxay yimaadeen Taroo'as. 9
Oo habeennimo ayaa Bawlos wax riyo ku arkay. Waxaa
taagnaa nin reer Makedoniya ah isagoo ka baryaya oo leh,
Makedoniya kaalay oo na caawi. 10 Oo markuu riyadii arkay
dabadeed markiiba waxaannu doonnay inaannu Makedoniya
tagno, taasoo nala noqotay in Ilaah noogu yeedhay inaannu
iyaga injiilka ku wacdinno. 11 Haddaba ayaannu Taroo'as ka
dhoofnay, oo waxaannu toos u aadnay Samotraki, maalintii
xigtayna waxaannu nimid Ne'abolis; 12 markaasaannu
meeshaas ka tagnay, oo waxaannu aadnay Filiboy, taas oo
ah magaalomadaxda reer Makedoniya, oo ay reer Rooma u
taliyaan, magaaladaas waxaannu joognay dhawr maalmood.
13 Maalintii sabtida ahayd ayaannu iridda ka baxnay, oo
waxaannu tagnay webi dhinaciis, meeshaas oo aannu u
malaynay meel lagu tukado; markaasaannu fadhiisannay,
oo waxaannu la hadallay dumarkii urursanaa. 14 Oo naag
Ludiya la odhan jiray, oo dhar guduudan iibin jirtay, oo
magaalada Tu'ateyra ka iman jirtay, oo Ilaah caabudi jirtay
baa na maqashay; taasoo Rabbigu qalbigeeda furay inay
dhegaysato waxyaalihii Bawlos ku hadlay. 15 Oo markii la
baabtiisay iyada iyo dadkii gurigeeda, ayay naga bariday
iyadoo leh. Haddaad qiyaasaysaan inaan Rabbiga aamin u
ahay, gurigayga kaalaya oo jooga. Waana na yeelsiisay. 16
Oo waxaa dhacday, markii aannu u sii soconnay meeshii
lagu tukan jiray, in ay naga hor timid gabadh jinni wax
sheega qabtaa, taasoo waxsheegiddeeda faa'iido badan ugu
keeni jirtay sayidyadeeda. 17 Taasaa Bawlos iyo annaga
na soo raacday, wayna qaylisay iyadoo leh, Nimankanu
waa addoommadii Ilaaha ugu sarreeya, kuwaasoo idinku
wacdiyaya jidka badbaadada. 18 Sidaasna maalmo badan
ayay yeelaysay. Laakiin Bawlos oo ka xumaaday ayaa u
jeestay oo jinnigii ku yidhi, Magaca Ciise Masiix ayaan
kugu amrayaa inaad iyada ka soo baxdid. Markaasuu
saacaddiiba ka soo baxay. 19 Laakiin sayidyadeedii, markay
arkeen in rajadii faa'iidadoodu dhammaatay, ayay Bawlos
iyo Silas qabteen, oo waxay u jiideen suuqa, taliyayaasha
hortooda, 20 oo markay xaakinnadana u keeneen, waxay
yidhaahdeen, Nimankanu iyagoo Yuhuud ah ayay si weyn
magaaladayada u dhibayaan, 21 oo waxay na barayaan
caadooyin aan noo xalaal ahayn inaannu aqbalno oo yeelno
annagoo reer Rooma ah. 22 Markaasaa dadkii badnaa
ku wada kaceen; oo xaakinnadiina dharkoodii bay ka
jeexeen, waxayna ku amreen in la uleeyo. 23 Oo markay
ulo badan ku dhufteen, ayay xabsiga ku rideen iyagoo
ku amraya xabsihayihii inuu aad u ilaaliyo; 24 isaguna
markuu amar caynkaas ah helay, wuxuu iyagii ku riday
xabsigii ugu hooseeyey, cagahoodana qori buu aad ugu
xidhay. 25 Laakiin abbaaraha habeenbadhka Bawlos iyo
Silas ayaa tukanayay oo Ilaah gabay ku ammaanayay,
maxaabiistuna way dhegaysanayeen; 26 oo filanla'aan
waxaa dhacay dhulgariir weyn, sidaas darteed aasaaskii
xabsigu waa ruxmay; oo markiiba albaabbadii oo dhammu
waa wada furmeen; mid walbana silsiladihiisii waa ka
furmeen. 27 Xabsihayihiina markuu hurdada ka toosay oo
arkay albaabbadii xabsiga oo wada furmay, ayuu seeftiisii
la baxay oo ku dhowaaday inuu isdilo, maxaa yeelay,
wuxuu u malaynayay maxaabiistii inay baxsatay. 28 Laakiin
Bawlos baa cod weyn ku qayliyey isagoo leh, Waxba ha
isyeelin; maxaa yeelay, kulligayo halkaannu wada joognaa.
29 Markaasuu cid u diray siraaddo, oo gudaha ku booday
isagoo baqdin la gargariiraya, oo wuxuu ku hor dhacay
Bawlos iyo Silas, 30 markaasuu dibadda u soo saaray, oo ku
yidhi, Sayidyadow, maxaa igu waajib ah inaan yeelo inaan
ku badbaado? 31 Kolkaasay ku yidhaahdeen, Rumayso
Rabbi Ciise, waadna badbaadi doontaa, adiga iyo dadka
gurigaaguba. 32 Oo ereyga Rabbiga ayay kula hadleen
isaga iyo kuwii gurigiisa joogay oo dhan. 33 Markaasuu
wakhtiga habeenka qudhiisa iyagii kaxeeyey oo nabrahoodii
ka maydhay; oo markiiba waa la baabtiisay isagii iyo dadkiisii
oo dhanba. 34 Haddaba gurigiisuu iyagii keenay oo cunto
hor dhigay. Isagoo Ilaah rumaysanna ayuu aad ula farxay
kuwii gurigiisa joogay oo dhan. 35 Laakiin kolkii ay maalin
noqotay ayaa xaakinnadii waxay direen saraakiishii oo leh,
Nimankaas sii daa. 36 Markaasaa xabsihayihii hadalladaas
u sheegay Bawlos, oo wuxuu ku yidhi, Xaakinnadii baa
amar soo diray in laydin sii daayo; haddaba soo baxa oo
nabad ku taga. 37 Laakiin Bawlos baa wuxuu iyagii ku
yidhi, Caddaan bay noogu garaaceen annagoo aan nala
xukumin oo ah niman reer Rooma, oo waxayna nagu rideen
xabsi; imminkana ma qarsoodii bay nooga saarayaan?
Sidaas ma aha; laakiin iyaga qudhoodu ha yimaadeen
oo dibadda ha noo saareen. 38 Haddaba saraakiishii baa
hadalladaas u sheegay xaakinnadii; oo kolkay maqleen inay
reer Rooma yihiin ayay baqeen. 39 Markaasay yimaadeen oo
cafi ka baryeen; oo kolkay dibadda u soo saareenna, waxay
weyddiisteen inay magaalada ka tagaan. 40 Oo markay
xabsigii ka soo baxeen waxay galeen gurigii Ludiya, oo
kolkay walaalihii arkeenna ayay dhiirigeliyeen oo ka tageen.

**17** Haddaba markay sii dhex mareen Amfibolis iyo
Abollooniya ayay waxay yimaadeen Tesaloniika
meeshaas oo sunagogga Yuhuuddu ahaa; 2 oo Bawlos sidii
caadadiisu ahayd, ayuu iyagii u galay, oo saddex sabtiyoodna
ayuu Qorniinka kala hadlay, 3 isagoo caddaynaya oo

muujinaya inay waajib ahayd in Masiixu silco oo ka soo
sara kaco kuwii dhintay, wuxuuna yidhi, Ciisahan aan idinku
wacdiyey waa Masiixa. 4 Oo waxaa la rumaysiiyey oo
Bawlos iyo Silas isku daray qaar iyaga ka mid ah oo ahaa
Gariig fara badan oo cibaadaysan iyo dumarka madaxda ah
oo aan fara yarayn. 5 Laakiin Yuhuuddii oo ka masayrsan
ayaa nimanka suuqa ka soo kaxaysatay kuwo shar leh, urur
bayna isu keeneen, oo magaaladii bay buuq ka dhigeen;
oo markay gurigii Yasoon weerareen ayay waxay dooneen
inay iyagii dadka u soo saaraan. 6 Oo markay waayeen,
ayay Yasoon iyo kuwo walaalo ah ku hor jiideen taliyayaashii
magaalada iyagoo ku qaylinaya oo leh, Kuwii dunida rogay
ayaa halkanna yimid, 7 iyagoo uu Yasoon martiggeliyey;
kuwaas oo dhanna waxay falaan wax ka gees ah amarrada
Kaysar, iyagoo leh, Waxaa jira boqor kale oo Ciise ah. 8
Markaasay dhib geliyeen dadkii badnaa iyo taliyayaashii
magaalada oo waxyaalahaas maqlay. 9 Oo kolkay Yasoon
iyo kuwii kale dammiin ka qaadeen, ayay sii daayeen. 10
Oo markiiba walaalihii waxay habeennimo Bawlos iyo Silas
u direen Beroya, kuwaas oo kolkay meeshaas yimaadeen
galay sunagogga Yuhuudda. 11 Haddaba kuwaasu waa ka
sharaf badnaayeen kuwii Tesaloniika joogay, maxaa yeelay,
ereygay aqbaleen iyagoo xiiso weyn u qaba oo maalin kasta
baadhaya Qorniinka inay hubsadaan waxyaalahaasi inay
sidaas yihiin iyo in kale. 12 Sidaas darteed kuwa badan
oo iyaga ka mid ah baa rumaystay iyo dumar Gariig ah
oo sharaf leh iyo niman aan fara yarayn. 13 Laakiin kolkii
Yuhuuddii Tesaloniika joogtay ogaatay in Bawlos ereyga
Ilaah Beroya ku wacdiyey, ayay meeshaasna yimaadeen
oo qas iyo dhib geliyeen dadkii badnaa. 14 Markaasaa
walaalihii kolkiiba Bawlos u direen inuu tago ilaa badda; Silas
iyo Timoteyosna halkaasay weli joogeen. 15 Laakiin kuwii
Bawlos ambabbixiyey waxay isagii keeneen ilaa Ateenay;
markaasay ka tageen iyagoo Silas iyo Timoteyos amar u
qaadaya inay degdeg u yimaadaan. 16 Haddaba Bawlos intuu
Ateenay ku sugayay iyagii, ruuxiisu waa kacay markuu arkay
magaalada oo sanamyo ka buuxaan. 17 Saas daraaddeed
ayuu Yuhuuddii iyo nimankii cibaadaysnaa kula xaajooday
sunagogga, suuqa dhexdiisana ayuu maalin walba kula
xaajooday kuwii kula kulmayba. 18 Waxaana la kulmay
isagii kuwo ka mid ah faylosuufiinta Ebikuriyiin iyo Istoo'ikiin
ah. Qaar baa waxay yidhaahdeen, Ninkan dawdarka ihi
muxuu odhan doonaa? Qaar kalena waxay yidhaahdeen,
Wuxuu u eg yahay nin ilaahyo qalaad wax ka sheega; maxaa
yeelay, wuxuu dadkii ku wacdiyey Ciise iyo sarakicidda. 19
Markaasay isagii qabteen, oo waxay u kaxeeyeen Are'obagos
iyagoo ku leh, Ma ogaan karnaa waxay tahay waxbariddan
cusub oo aad ku hadlaysid? 20 Waayo, waxaad dhegahayaga
maqashiisaa waxyaalo qalaad. Sidaa darteed waxaannu
doonaynaa inaannu ogaanno waxyaalahanu waxay yihiin.
21 (Haddaba reer Ateenay oo dhammi iyo dadkii qalaad oo
halkaas degganaa, wakhtigooda wax kale kuma ay dhaafin
inay sheegaan ama maqlaan wax cusub mooyaane.) 22
Markaasaa Bawlos oo Are'obagos dhex taagan wuxuu yidhi,
Nimankiinan reer Ateenay ahow, wax kasta waxaan idinku
garanayaa inaad tihiin kuwo ilaahyada ka cabsada. 23
Waayo, markaan soo socday oo aan arkay waxyaalaha
aad caabuddaan waxaan soo arkay oo kale meel allabari
oo lagu qoray, Waxaa leh ilaah aan la oqoon. Haddaba
waxaad oqoonla'aanta ku caabuddaan ayaan wax idiinka
sheegayaa. 24 Ilaaha sameeyey dunida iyo waxyaalaha
ku jira oo dhanba, oo ah Rabbiga samada iyo dhulka,
ma deggana macbudyo gacmo lagu sameeyey, 25 gacmo
dadna looguma adeego sidii isagoo wax u baahan, maxaa
yeelay, dhammaan isagaa siiya nolosha iyo neefta iyo wax
walbaba; 26 oo quruun kasta oo bini-aadmi ah ayuu isaga
mid dhigay inay dunida dusheeda oo dhan degganaadaan
isagoo gooyay xilliyaduu hore u diyaarshay iyo xadadka
degmooyinkooda; 27 inay Ilaah doondoonaan, in hadday
suurtowdo ay haabhaabtaan oo ay helaan isaga, in kastoo
uusan ka fogayn midkeen kasta; 28 maxaa yeelay, isagaynu
ku nool nahay, kuna soconnaa, kuna jirnaa; sidaasoo
kuwo ka mid ah gabayayaashiinnu ay yidhaahdeen, Weliba
innaguna waxaynu nahay farcankiisa. 29 Haddaba innagoo
ah Ilaah farcankiis waa inaynaan ka fikirin in Ilaahnimadu ay
la mid tahay dahab ama lacag ama dhagax oo lagu xardhay
sancada iyo farsamada dadka. 30 Haddaba wakhtiyadii
oqoonla'aanta Ilaah baa dhaafay, laakiin hadda wuxuu dadka
ku amrayaa in dhammaantood meel kastaba ha joogeene
ay soo toobadkeenaan; 31 maxaa yeelay, wuxuu dhigay
maalin uu dunida si xaq ah ugu xukumi doono ninkuu
doortay, taasoo uu dhammaan ugu caddeeyey sarakicidda
uu isagii ka soo sara kiciyey kuwii dhintay. 32 Haddaba
kolkay maqleen wax ku saabsan ka soo sarakicidda kuwii
dhintay, qaar waa ku qosleen, laakiin qaar kale waxay
yidhaahdeen, Mar kale ayaannu waxan kaa maqli doonnaa.
33 Haddaba Bawlos waa ka dhex tegey iyagii. 34 Laakiin
niman baa raacay isagii oo rumaystay; kuwaasoo ay ka
mid ahaayeen Diyonusiyos ki Are'obagos, iyo haweenay la
odhan jiray Damaris, iyo kuwo kale oo la socdayba.

**18** Waxyaalahaas dabadeed Ateenay ayuu ka tegey, oo
wuxuu yimid Korintos. 2 Meeshaasna wuxuu ka helay
Yuhuudi Akula la odhan jiray, oo reer Bontos ah, oo mar

dhow haweenaydiisa Bariskilla kala yimid Itaaliya, maxaa
yeelay, Kalawdiyos baa ku amray Yuhuudda oo dhan inay
Rooma ka tagaan; wuuna u yimid iyagii. **3** Isaguna la
shuqul buu ahaa, sidaas darteed ayuu ula joogay iyagii,
wayna shaqeeyeen; waayo, xagga shuqulkooda waxay
ahaayeen taambuug-sameeyayaal. **4** Oo wuxuu sabti walba
sunagogga kula doodi jiray oo soo jeedin jiray Yuhuud iyo
Gariigba. **5** Laakiin markii Silas iyo Timoteyos Makedoniya ka
yimaadeen, hadalka ayaa haystay Bawlos isagoo Yuhuudda
hortooda ka sheegaya in Ciise yahay Masiixa. **6** Oo markay
is hor taageen oo caytameen, isagu dharkiisuu hurgufay
oo ku yidhi iyagii, Dhiiggiinnu madaxiinna ha dul ahaado;
anigu nadiif baan ahay, hadda ka dib waxaan u tegi doonaa
dadka aan Yuhuudda ahayn. **7** Markaasuu meeshaas
ka tegey, oo wuxuu galay gurigii ninka Tiitos Yuustos la
odhan jiray, kaasoo Ilaah caabudi jiray, oo gurigiisu ku
xigay sunagogga. **8** Markaasaa Kirisbos oo sunagogga u
sarreeyey baa Rabbiga rumaystay, isaga iyo kuwii gurigiisa
oo dhanba; kuwo badan oo reer Korintos ahna ayaa markay
maqleen rumaystay, oo waa la baabtiisay. **9** Haddaba
Rabbiga ayaa wuxuu Bawlos habeennimo riyo ku yidhi, Ha
cabsanin, laakiin hadal, hana aamusin; **10** maxaa yeelay,
anaa kula jooga, ninnana kuma dhici doono inuu wax ku
yeelo, waayo, dad badan baan magaaladan ku leeyahay. **11**
Meeshaasna sannad iyo lix bilood ayuu joogay, oo wuxuu
dhexdooda barayay ereyga Ilaah. **12** Laakiin kolkii Galliyo
ahaa taliyaha Akhaya, Yuhuuddii oo isku qalbi ah baa ku
kacday Bawlos, oo waxay hor keeneen kursigii xukumaadda
iyagoo leh, **13** Ninkanu wuxuu dadka yeelsiiyaa inay Ilaah
u caabudaan si sharciga ka gees ah. **14** Laakiin kolkii
Bawlos u dhowaa inuu afkiisa kala qaado ayaa Galliyo
Yuhuuddii ku yidhi, Kuwiinnan Yuhuudda ahow, xaajadii
hadday tahay xaqdarro ama xumaan shar ah, sababtaas
waan idiinku dulqaadan lahaa; **15** laakiin hadday yihiin
su'aalo ku saabsan hadallo iyo magacyo iyo sharcigiinna,
idinka qudhiinnu fiiriya, maxaa yeelay, anigu dooni maayo
inaan waxyaalahaas xaakin u ahaado. **16** Markaasuu iyagii
ka eryay kursigii xukumaadda. **17** Kolkaasay kulligood waxay
qabteen Sostenees oo sunagogga u sarreeyey, wayna ku
garaaceen isagii kursigii xukumaadda hortiisa. Galliyona dan
kama gelin waxyaalahaas. **18** Markaasaa Bawlos maalmo
badan sii joogay, dabadeed ayuu walaalihii ka tegey, oo
wuxuu u dhoofay Suuriya, isagoo ay la socdaan Bariskilla iyo
Akula, wuxuuna Kenekhreya hore ugu xiirtay madaxa, maxaa
yeelay, nidar buu galay. **19** Markaasay waxay yimaadeen
Efesos, oo halkaasuu iyagii kaga tegey; laakiin isagu wuxuu
galay sunagogga oo la dooday Yuhuuddii. **20** Oo markay
weyddiisteen inuu wakhti ka sii dheer joogo, ma uu oggolaan;
**21** laakiin markuu ka tegey ayuu ku yidhi, Mar kalaan idiin
soo noqon doonaa haddii Ilaah doonayo, markaasuu Efesos
ka dhoofay. **22** Oo markuu Kaysariya ku soo degay, ayuu
wuxuu u aaday oo salaamay kiniisadda, markaasuu Antiyokh
aaday. **23** Markuu intii mudda ah meeshaas joogayna, wuu
ka tegey, markaasuu meel meel u sii dhex maray dalalka
Galatiya iyo Farugiya isagoo xertii adkaynaya. **24** Haddaba
waxaa Efesos yimid Yuhuudi Abolloos la odhan jiray oo
reer Iskanderiya ahaa, oo wuxuu ahaa nin hadalyaqaan
ah, oo Qorniinka garasho xoog leh u leh. **25** Ninkaas jidka
Rabbiga hore baa loo baray; oo isagoo ruuxa ku kulul
ayuu ku hadlay oo hagaag u baray waxyaalihii Ciise ku
saabsanaa, isagoo garanaya baabtiiskii Yooxanaa oo keliya;
**26** oo wuxuu bilaabay inuu geesinimo kaga dhex hadlo
sunagogga. Laakiin Bariskilla iyo Akula, markay maqleen
isagii, ayay kaxaysteen, kolkaasay aad ugu sii caddeeyeen
jidka Ilaah. **27** Oo markuu damcay inuu u sii dhaafo Akhaya,
ayaa walaalihii dhiiro geliyeen, oo waxay xerta u qoreen inay
soo dhoweeyaan isagii; markuu yimidna aad buu u caawiyey
iyagii, kuwaasoo nimco ku rumaystay, **28** maxaa yeelay,
si xoog leh ayuu Yuhuuddii u garansiiyey oo caddaan ugu
tusay Qorniinka in Ciise yahay Masiixa.

**19** Haddaba waxaa dhacay, markii Abolloos Korintos
joogay, in Bawlos oo soo dhex maray waddanka sare
yimid Efesos, oo halkaas wuxuu kula kulmay kuwo xer
ah. **2** Markaasuu ku yidhi iyagii, Ruuxa Quduuska ah ma
hesheen markaad rumaysateen? Kolkaasay ku yidhaahdeen,
Maya, maba aannu maqlin in Ruuxa Quduuska ahi jiro iyo
in kale. **3** Markaasuu ku yidhi, Haddaba maxaa laydinku
baabtiisay? Oo waxay ku yidhaahdeen, Baabtiiskii Yooxanaa.
**4** Bawlosna wuxuu ku yidhi, Yooxanaa wuxuu dadka ku
baabtiisay baabtiiska toobadda, isagoo dadkii ku leh, Waa
inaad rumaysataan kan iga daba iman doona, isagoo ula
jeeda Ciise. **5** Oo markay waxaas maqleen, waxaa iyagii lagu
baabtiisay Rabbi Ciise magiciisa. **6** Markii Bawlos gacmaha
dul saarayna ayaa Ruuxa Quduuska ahu ku soo degay iyagii;
markaasay afaf kale ku hadleen oo ay wax sii sheegeen; **7**
nimankii oo dhanna waxay ahaayeen abbaaraha laba iyo
toban. **8** Haddaba sunagogga ayuu galay, oo meeshaas
ayuu saddex bilood geesinimo kaga dhex hadlay, isagoo
dadka la doodaya oo u soo jeedinaya waxyaalo ku saabsan
boqortooyada Ilaah. **9** Laakiin qaarkood markay madax
adkaadeen oo caasiyoobeen, iyagoo xumaan kaga hadlaya
Jidka dadkii badnaa hortooda, ayuu iyagii ka tegey oo
xertii ka soo soocay, oo maalin walba ayuu dad kula doodi
jiray iskoolka Turannos. **10** Taasuna laba sannadood ay

socotay, si dadkii Aasiya degganaa, oo Yuhuud iyo Gariigba
lahaa, ay u wada maqleen ereyga Rabbiga. 11 Ilaahna
wuxuu gacmaha Bawlos ku sameeyey cajaa'ibyo khaas
ah, 12 sidaas aawadeedna waxaa jidhkiisa kuwii bukay
looga keenay marooyin yaryar ama macawiso, markaasaa
cudurradii iyagii daayeen, jinniyadiina waa ka baxeen.
13 Laakiin kuwo Yuhuudda wareegi jirtay ka mid ah oo
jinniyosaarayaal ah baa waxay ku talo jireen inay kuwii
jinniyada qabay ka dul yidhaahdaan magaca Rabbi Ciise,
iyagoo leh, Waxaan idinku dhaarinayaa Ciisaha Bawlos
dadka ku wacdiyo. 14 Waxaa jiray oo sidaas sameeyey
toddoba wiil oo Iskeba dhalay, kaasoo ahaa wadaad sare
oo Yuhuudi ah. 15 Markaasaa jinnigii u jawaabay oo ku
yidhi iyagii, Ciise ayaan garanayaa, Bawlosna waan aqaan,
idinkuse yaad tihiin? 16 Haddaba ninkii jinniga qabay baa
ku booday iyagii, wuuna ka xoog badiyey kulligood, oo ka
adkaaday, sidaas darteed ayay gurigaas ka carareen, iyagoo
qaawan oo dhaawacan. 17 Markaasaa waxaa taas wada
ogaaday Yuhuuddii iyo Gariigtii oo dhan oo Efesos joogtay;
baqdinna waa wada gashay dhammaantood, magaca Rabbi
Ciisena waa la weyneeyey. 18 Markaasaa qaar badan oo
rumaystay yimaadeen iyagoo qiranaya oo caddaysanaya
falimahooda. 19 Kuwii sixir fali jirayna qaarkood intay
kitaabbadoodii ururiyeen ayay dadka hortooda ku wada
gubeen; wayna tiriyeen qiimadooda, oo waxay arkeen inay
ahayd konton kun oo gogo' oo lacag ah. 20 Sidaasaa ereygii
Rabbigu xoog ugu batay oo u adkaaday. 21 Haddaba markii
waxyaalahaasu dhammaadeen ayaa Bawlos ruuxiisa kula
talo jiray inuu Yeruusaalem tago markuu Makedoniya iyo
Akhaya sii dhex maray dabadeed, isagoo leh, Markaan
meeshaas tago dabadeed, waa inaan Roomana arko. 22
Markaasuu wuxuu Makedoniya u diray laba ka mid ah kuwii
isaga u adeegi jiray oo ahaa Timoteyos iyo Erastos, isaga
qudhiisuse wuxuu ku hadhay Aasiya intii muddo ah. 23
Haddaba waxaa wakhtigaas kacday rabshad aan yarayn oo
ku saabsan Jidka. 24 Maxaa yeelay, ninkoo Deemeetriyos la
odhan jiray oo lacagtume ahaa, oo macbudyo yaryar oo
Di'ana lacag ka samayn jiray, wuxuu sancaawiyadii u keeni
jiray faa'iido aan yarayn; 25 kuwaasoo uu isla soo ururiyey
raggii la shuqul ahaa isagoo ku leh, Niman yahow, waad
og tihiin inaynu shuqulkan ka helno hodantinimadeenna.
26 Waxaad arkaysaan oo aad maqlaysaan in Bawloskanu
sasabay oo jeediyey dad badan, oo aan kuwii Efesos oo
keliya ahayn, laakiin kuwii joogay Aasiya badidood, isagoo
leh, Ilaahyo gacmo lagu sameeyo, ilaahyo ma aha. 27 Khatar
uma aha shuqulkeenna oo keliya in la quudhsado, laakiin
waxay khatar u tahay oo kale in macbudka ilaahadda weyn
oo Di'ana la fududaysto, weynaanteedana laga baabbi'iyo,
taasoo Aasiya oo dhan iyo duniduba ay wada caabudaan.
28 Oo markay taas maqleen, aad bay u cadhoodeen, wayna
dhawaaqeen iyagoo leh, Waxaa weyn Di'anada reer Efesos.
29 Magaaladii oo dhammuna waa wada qasnayd; waxayna
qabsadeen Gayos iyo Aristarkhos oo ahaa niman reer
Makedoniya oo la socdaali jiray Bawlos, markaasay iyagoo
isku wada qalbi ah te'atradii ku yaaceen. 30 Kolkii Bawlos
damcay inuu dadkii dhex galo, xertii uma ay oggolaan isagii.
31 Haddaba qaar ka mid ah madaxda Aasiya oo saaxiibbo
u ahaa isagii ayaa u soo cid diray, oo waxay ka baryeen
inuusan isku biimayn te'atradii. 32 Haddaba qaar wax bay
ku qayliyeen, qaar kalena wax kalay ku qayliyeen, maxaa
yeelay, ururkii waa qasnaa, badidooduna ma ay garanayn
waxay isugu yimaadeen. 33 Markaasay Aleksanderos ka
soo saareen dadkii badnaa isagoo ay Yuhuuddii hore u soo
tuurayaan. Markaasaa Aleksanderos gacan taagay, oo wuxuu
damci lahaa inuu af isku daafaco dadka hortiisa. 34 Laakiin
kolkay garteen inuu Yuhuudi yahay ayay dhammaan intii
laba saacadood ah isku cod ku qayliyeen iyagoo leh, Waxaa
weyn Di'anada reer Efesos. 35 Markuu karaanigii magaaladu
aamusiiyey dadkii badnaa, ayuu ku yidhi, Nimankiinan reer
Efesosow, ninkee baan oqoon in magaalada Efesos ay tahay
ta ilaalisa macbudka Di'anada weyn iyo sanamkii Yubiter
ka soo dhacay? 36 Waxyaalahaasu waa wax aan la dafiri
karin, sidaas daraaddeed waxaa idinku waajib ah inaad
xasilloonaataan oo aydnaan samayn wax qamaam ah. 37
Waayo, waxaad halkan keenteen nimankan iyagoo aan ahayn
kuwo macbudyo dhaca ama kuwo caaya ilaahaddeenna.
38 Sidaas daraaddeed haddii Deemeetriyos iyo kuwa la
shuqul ah ay nin wax ku haystaan, maxkamadahu waa furan
yihiin, xaakinnona waa jiraan; haddaba ha isdacweeyaan. 39
Laakiin haddii aad doonaysaan wax ku saabsan axwaal kale,
waxaa lagu gar gooyn doonaa ururkii sharciga. 40 Haddaba
waxaa khatar inoo ah in laynagu ashtakeeyo rabshaddii
maanta aawadeed, iyadoo aan sababu u jirin; taasoo aynaan
kari doonin inaynu wax ka sheegno buuqan. 41 Oo goortuu
waxyaalahaas ku hadlay dabadeed ayuu ururkii kala diray.

20 Markii rabshaddii dhammaatay dabadeed Bawlos
ayaa xertii u cid diray oo dhiirrigeliyey, markaasuu
nabadgelyeeyey oo baxay inuu Makedoniya tago. 2 Oo kolkuu
meelahaas sii dhex maray oo uu hadal badan ku dhiirrigeliyey
iyagii, ayuu wuxuu yimid dalka Gariigta. 3 Oo markuu saddex
bilood meeshaas joogay, oo Yuhuuddu shirqool u dhigtay,
markuu u dhowaa inuu Suuriya u dhoofo, ayuu wuxuu
goostay inuu Makedoniya ku soo dhex noqdo. 4 Waxaana

isagii ilaa Aasiya sii raacay Soobater ina Burhus oo reer
Beroya ah, iyo Aristarkhos iyo Sekundos oo reer Tesaloniika
ah, iyo Gayos oo reer Derbe ah, iyo Timoteyos, iyo Tukhikos
iyo Torofimos oo reer Aasiya ah. **5** Laakiin kuwaasu mar
horay tageen oo waxay nagu sugayeen Taroo'as. **6** Maalmihii
Iiddii Kibistii-aan-khamiirka-lahayn dabadeed waxaannu ka
dhoofnay Filiboy, oo shan maalmood ayaan iyagii ugu nimid
Taroo'as; taasoo aannu toddoba maalmood joognay. **7**
Maalintii ugu horraysay ee toddobaadka markaannu isugu
nimid inaannu kibis jejebinno, ayaa Bawlos la hadlay iyagii,
isagoo ku talo jira inuu maalinta dambe tago, hadalkiina
ilaa habeenbadhkii ayuu sii dheereeyey. **8** Siraaddo badan
baa ka baxayay qowladda sare oo aannu ku urursanayn.
**9** Waxaana daaqadda fadhiyey nin dhallinyaro ah oo la
odhan jiray Yutukhos, isagoo hurdo weyn la dhacay; oo intii
Bawlos weli hadalkii sii dheeraynayay ayaa wiilkii oo aad u
hurdaysan dabaqaddii saddexaad ka soo dhacay, oo isagoo
meyd ah baa la qaaday. **10** Markaasaa Bawlos hoos u soo
degay oo ku dul dhacay isagii, waana isku duubay, isagoo
leh, Ha buuqina; maxaa yeelay, naftii waa ku jirtaa. **11** Oo
markuu dusha aadayna oo kibis jejebiyey oo cunay oo wakhti
dheer la hadlay iyagii, ilaa waagii beryay, ayuu markaas ka
tegey. **12** Wiilkiina way keeneen isagoo nool, si aan yarayn
baana loo qalbi qaboojiyey iyagii. **13** Laakiin annagoo ka hor
marayna, waxaannu aadnay doonnida, oo Asos u dhoofnay,
meeshaasoo aannu doonaynay inaannu Bawlos ka qaadno;
maxaa yeelay, sidaasuu kula ballamay isagoo ku talo jiray
inuu lugeeyo. **14** Oo kolkuu Asos nagula kulmay, waannu soo
qaadnay, oo waxaannu nimid Mituleenee. **15** Markaasaannu
halkaas ka dhoofnay, oo waxaannu maalintii dambe nimid
meel ka soo hor jeedda Khiyos; maalintii kalena waxaannu
gaadhnay Samos; maalintii ku xigtayna waxaannu nimid
Mileetos. **16** Maxaa yeelay, Bawlos wuxuu goostay inuu
Efesos dhaafo, inuusan wakhti Aasiya ku lumin; waayo,
wuxuu ku degdegsanaa hadday u suurtowdo inuu maalintii
Bentekoste Yeruusaalem yimaado. **17** Haddaba Mileetos
wuxuu cid uga diray Efesos, waana u yeedhay waayeelladii
kiniisadda. **18** Markay u yimaadeenna wuxuu iyagii ku yidhi,
Idinka qudhiinnuba waad garanaysaan sidii aan wakhtiga oo
dhan idinkula joogay tan iyo maalintii iigu horraysay oo aan
Aasiya cag saaray, **19** anigoo Rabbiga ugu adeegaya is-
hoosaysiin oo dhan, iyo ilmo, iyo jirrabaaddaha igu dhacay
markii Yuhuuddu sirqoollada ii dhigtay; **20** iyo sidii aanan
waxba idiinkala hadhin wixii idiin faa'iido lahaa inaan idiin
sheego oo caddaan idinku baro guri ilaa guri, **21** anigoo
Yuhuudda iyo Gariigta labadoodaba uga warramaya si ay
Ilaah ugu toobadkeenaan oo ay u aaminaan Rabbigeenna
Ciise Masiix. **22** Hadda bal eega, Yeruusaalem baan tegayaa
anoo Ruuxa ku xidhan oo aan garanaynin waxyaalaha
halkaas igaga dhici doona; **23** in Ruuxa Quduuska ahi
magaalo kasta iigu markhaati furo mooyaane, isagoo leh,
Waxaa ku sugaya silsilado iyo dhibaatooyin. **24** Laakiin
naftayda uma xisaabo sidii mid qiimo ila leh, si aan u
dhammeeyo tartankayga iyo shuqulkii aan Rabbi Ciise ka
helay inaan u markhaati furo injiilkii nimcadii Ilaah. **25** Hadda,
bal eega, waxaan ogahay in dhammaantiin oo aan ku dhex
wareegi jiray oo aan boqortooyada ku wacdiyi jiray aydnaan
mar dambe wejigayga arki doonin. **26** Sidaas daraaddeed
waxaan maanta idiinku warramayaa inaan daahir ka ahay
dadka oo dhan dhiiggiisa. **27** Maxaa yeelay, dib ugama
noqon inaan talada Ilaah oo dhan idiin sheego. **28** Qudhiinnu
isjira, idahana jira, kuwaasoo Ruuxa Quduuska ahu idiinka
dhigay beldaajiyayaal inaad daajisaan kiniisadda Ilaah oo uu
dhiiggiisa ku iibsaday. **29** Waxaan ogahay markaan tago
dabadeed inay idin dhex geli doonaan uubatooyin xunxun
iyagoo aan idaha wax ka reebaynin; **30** oo waxaa idinka
dhex kici doona niman waxyaalo qalqalloocan ku hadlaya
inay xertii u jiitaan xaggooda. **31** Sidaas darteed, soo jeeda,
idinkoo xusuusanaya in intii saddex sannadood ah aanan
ka joogsan inaan mid kasta habeen iyo maalinba waaniyo
anigoo ilmaynaya. **32** Imminka waxaan idinku ammaano
gelinayaa Ilaah iyo ereyga nimcadiisa kaasoo kara inuu
idin dhiso oo dhaxal idinka dhex siiyo kuwa quduus laga
dhigay oo dhan. **33** Ma aan damcin ninna lacagtiis, ama
dahabkiis, ama dharkiis. **34** Idinka qudhiinnu waad og tihiin
inay gacmahanu u adeegeen waxaannu u baahnayn aniga
iyo kuwii ila joogayba. **35** Wax walba waan idin tusay si ay
waajib idiinku tahay, idinkoo sidaas oo kale u hawshoonaya,
inaad caawisaan kuwa itaalka yar, oo aad xusuusataan
ereyadii Rabbi Ciise siduu isaga qudhiisu yidhi, In wax la
helo, waxaa ka barako badan in wax la bixiyo. **36** Markuu
waxaas ku hadlay dabadeed ayuu jilba joogsaday oo la
tukaday dhammaantood. **37** Markaasay kulligood aad u wada
ooyeen, oo Bawlos qoorta kaga dhaceen oo dhunkadeen,
**38** iyagoo sida badan ka caloolxun hadalkuu ku hadlay oo
ahaa inayan mar dambe wejigiisa arki doonin. Markaasay sii
ambabbixiyeen isagii ilaa doonnidii.

**21** Oo waxaa dhacday, markaannu iyagii ka tagnay oo
dhoofnay dabadeed, inaannu toos u nimid Koos,
maalintii dambena waxaannu nimid Rodos, meeshaasna
waxaannu ka aadnay Batara; **2** oo markaannu helnay doonni
Foynike u sii dhaafaysa ayaannu fuulnay oo ku dhoofnay. **3**
Oo kolkii Qubrus noo muuqatay, ayaannu dhinaca bidixda ka

marnay oo u dhoofnay Suuriya, oo waxaannu ku degnay
Turos, maxaa yeelay, meeshaasaa doonnidu shixnaddeedii
ku dejin lahayd. 4 Oo markaannu xertii ka helnay, ayaannu
meeshaas joognay toddoba maalmood; oo kuwaasu waxay
Ruuxa ugu sheegeen Bawlos inaanu Yeruusaalem cag saarin.
5 Oo markii maalmahaasu noo dhammaadeen ayaannu
ka tagnay oo sii soconnay; oo dhammaantood, iyaga iyo
dumarkoodii iyo carruurtoodiiba, ayay na sii ambabbixiyeen
ilaa magaalada dibaddeeda; markaasaannu xeebta ku
jilba joogsannay oo tukannay, 6 oo isnabadgelyaynay;
kolkaasaannu doonnidii fuulnay, iyaguse guryahoodii bay
ku noqdeen. 7 Oo markii dhoofkii aannu Turos ka soo
dhoofnay noo dhammaaday, waxaannu nimid Botolemays;
markaasaannu walaalihii soo salaannay oo maalin la joognay
iyagii. 8 Maalintii dambena waannu ka tagnay, oo waxaannu
nimid Kaysariya; markaasaannu galnay gurigii Filibos oo
ahaa kii wax wacdiyi jiray oo toddobadii ka mid ahaa,
oo isagaannu la joognay. 9 Ninkanu wuxuu lahaa afar
gabdhood oo bikrado ah oo wax sheegi jiray. 10 Kolkaannu
maalmo badan meeshaas joognay, waxaa Yahuudiya ka
yimid nebi la odhan jiray Agabos. 11 Oo markuu noo
yimid ayuu qaatay Bawlos dhex-xidhkiisii oo ku xidhxidhay
gacmihiisii iyo cagihiisii isagoo leh, Ruuxa Quduuska ahu
sidaasuu leeyahay, Yuhuudda Yeruusaalem joogtaa sidaasay
u xidhi doonaan ninka dhex-xidhkan leh, oo waxay isagii u
gacangelin doonaan dadka aan Yuhuudda ahayn. 12 Annaga
iyo kuwii meeshaas joogayba, markaannu waxyaalahaas
maqalnay, waxaannu isagii ka barinnay inuusan Yeruusaalem
tegin. 13 Markaasaa Bawlos u jawaabay oo ku yidhi,
Maxaad samaynaysaan oo aad u ooyaysaan oo ii qalbi
jebinaysaan? Maxaa yeelay, diyaar uma ihi inaan xidhnaado
oo keliya, laakiinse waxaan u diyaarahay inaan Yeruusaalem
ku dhinto magaca Rabbi Ciise aawadiis. 14 Oo markii la
yeelsiin waayay, waannu iska daynay, oo waxaannu nidhi,
Rabbiga doonistiisu ha noqoto. 15 Maalmahaas dabadeedna,
alaabtayadii baannu diyaarsannay, oo waxaannu tagnay
Yeruusaalem. 16 Oo waxaa na raacay qaar ka mid ahaa
xerta Kaysariya iyagoo wada mid Manasoon la odhan
jiray oo reer Qubrus ahaa oo xertii hore ka mid ahaa,
kaasoo aannu u hoyan lahayn. 17 Markaannu Yeruusaalem
nimidna walaalihii farxad bay nagu soo dhoweeyeen. 18
Maalintii ku xigtayna Bawlos oo nala socda ayaannu
waxaannu u tagnay Yacquub; waayeelladii oo dhammuna
way joogeen. 19 Markuu iyagii salaamay dabadeedna,
mid mid buu ugu sheegay waxyaalihii Ilaah dadka aan
Yuhuudda ahayn dhexdooda kaga sameeyey shuqulkiisa. 20
Iyaguna, kolkay taas maqleen, ayay Ilaah ammaaneen; oo
waxay ku yidhaahdeen isagii, Walaalow, waad aragtaa intay
yihiin kumanyaalka rumaystay oo Yuhuudda ku dhex jira;
kulligoodna sharcigay ku kulul yihiin. 21 Iyagana waa loo
sheegay wax kugu saabsan inaad Yuhuudda quruumaha ku
dhex jirta bartid inay Muuse ka tagaan adigoo u sheegaya
inaanay carruurtooda gudin oo aanay caadooyinka ku socon.
22 Haddaba waa maxay? Way wada maqli doonaan inaad
timid. 23 Sidaas darteed waxaannu kuu sheegayno yeel.
Waxaa nala jooga afar nin oo nidar galay; 24 kuwaas kaxee
oo isla daahiri oo kharashka iyaga ka bixi inay madaxa
xiirtaan; markaasay dhammaan waxay wada ogaan doonaan
inaanay waxba ahayn waxyaalihii lagaa sheegay, laakiin
inaad adiga qudhaadu si hagaagsan u socotid oo aad
sharciga dhawrtid. 25 Laakiin wax ku saabsan dadkii aan
Yuhuudda ahayn oo rumaystay ayaannu qornay, annagoo ku
amrayna inay iska ilaaliyaan waxa sanamyada loo sadqeeyo,
iyo dhiigga, iyo waxa la ceejiyo, iyo sinada. 26 Markaasaa
Bawlos nimankii kaxeeyey, oo maalintii dambena intuu iyagii
isla daahiriyey ayuu macbudka galay, isagoo caddaynaya
maalmihii isdaahirinta dhammaadkoodii, ilaa intii sadqada
loo sadqeeyey mid kasta oo iyagii ka mid ahaa. 27 Oo
kolkii toddobadii maalmood u dhowayd inay dhammaadaan
ayaa Yuhuuddii Aasiya ka timid isagii macbudka ku aragtay,
markaasay dadkii oo dhan kiciyeen, wayna qabteen isagii,
28 iyagoo qaylinaya oo leh, Nimankii reer binu Israa'iilow,
na caawiya. Kanu waa ninka bara dadka oo dhan oo meel
kasta jooga inay ka gees noqdaan dadka iyo sharciga iyo
meeshan. Weliba wuxuu macbudka keenay dad Gariig ah,
meeshan quduuska ahna xaaraan buu ka dhigay. 29 Maxaa
yeelay, mar hore waxay magaalada kula arkeen Torofimos
oo reer Efesos ahaa, kaasoo ay u maleeyeen in Bawlos
macbudka keenay. 30 Markaasaa magaaladii oo dhammu
kacday, dadkuna waa isku soo yaacay; kolkaasay Bawlos
qabteen oo macbudka ka jiideen; oo markiiba albaabbadii
waa la xidhay. 31 Markay damceen inay isagii dilaan ayaa
war u yimid sirkaalkii ka sarreeyey ciidankii in Yeruusaalem
oo dhan rabshaysan tahay. 32 Markaasuu wuxuu watay
askar iyo kuwo boqol askari u taliya, hoos buuna u soo
orday; iyaguna, markay arkeen sirkaalkii sare iyo askartii,
ayay Bawlos garaacidda ka daayeen. 33 Markaasaa sirkaalkii
sare ku soo dhowaaday oo qabtay isagii, oo wuxuu ku
amray in lagu xidho laba silsiladood; waana weyddiiyey
ninkuu yahay iyo wuxuu sameeyey. 34 Qaar waxay ku
qayliyeen wax, qaarna wax kale, dadkii badnaa dhexdiis,
oo markuu runtii garan kari waayay rabshaddii aawadeed
ayuu ku amray in qalcaddii la geeyo. 35 Oo markii Bawlos
sallaankii fuulay, waxaa dhacay in askartii kor u qaadday

isagii dadkii badnaa xooggooda aawadiis, **36** waayo, dadkii
faraha badnaa waa daba socday, iyagoo qaylinaya oo leh,
Naga fogeeya. **37** Markay u dhowayd in Bawlos qalcaddii la
keeno ayuu sirkaalkii sare ku yidhi, Ma ii suurtowdaa inaan
wax ku idhaahdo? Markaasuu ku yidhi, Af Gariig ma taqaan?
**38** Haddana miyaanad ahayn Masrigii maalmahan hortoodii
rabshad kiciyey oo afarta kun oo nin oo dhiigqabayaal ah
cidlada u kaxeeyey? **39** Laakiin Bawlos wuxuu ku yidhi,
Anigu waxaan ahay nin Yuhuudi ah oo reer Tarsos ah
taasoo Kilikiya ku taal, oo waxaan ahay magaalo aan yarayn
waddanigeed. Waxaan kaa baryayaa inaad ii fasaxdid inaan
dadka la hadlo. **40** Oo kolkuu fasaxayna, Bawlos isagoo
sallaankii taagan, ayuu dadkii gacan u taagay; oo markii aad
loo aamusay, ayuu af Cibraaniga kula hadlay iyagii, isagoo
leh,

**22** Walaalayaal iyo aabbayaalow, maqla isdaafacidda aan
imminka idiin sheegayo. **2** Kolkay maqleen inuu af
Cibraaniga kula hadlay, ayay sidii hore ka sii aamuseen.
Markaasuu ku yidhi, **3** Waxaan ahay nin Yuhuudi ah oo ku
dhashay Tarsos oo ku taal Kilikiya, laakiin magaaladan baa
laygu koriyey anoo Gamalii'eel hoostiisa wax laygu baray
sidii caadadii adkayd oo sharcigii awowayaasheen, anigoo
Ilaah qiiro u leh sida aad dhammaantiin maanta tihiin. **4**
Jidkanna waan silcin jiray tan iyo dhimasho, anigoo xidhaya
oo xabsiga geeynaya rag iyo dumarba. **5** Sidatan ayay
iigu markhaati furayaan wadaadka sare iyo waayeelladii oo
dhammuba, kuwaasoo aan warqado uga helay walaalaha,
oo aan Dimishaq u sodcaalay inaan kuwa halkaas joogayna,
iyagoo xidhxidhan, Yeruusaalem keeno si loo ciqaabo. **6**
Oo waxaa dhacday, intaan sodcaalayay oo Dimishaq u soo
dhowaanayay, iyadoo duhur ah, in dhaqsiba iftiin weyn oo
samada ka yimid hareerahayga ka iftiimay. **7** Markaasaan
dhulka ku dhacay, oo waxaan maqlay cod igu leh, Sawlosow,
Sawlosow, maxaad ii silcinaysaa? **8** Markaasaan u jawaabay
oo ku idhi, Yaad tahay, Sayidow? Markaasuu igu yidhi,
Waxaan ahay Ciisaha reer Naasared oo aad silcinaysid. **9**
Oo kuwii ila joogayna runtii waxay arkeen iftiinkii, laakiin
ma ay maqlin kii ila hadlay codkiisii. **10** Markaasaan ku
idhi, Maxaan sameeyaa, Rabbiyow? Kolkaasaa Rabbigu
igu yidhi, Kac oo Dimishaq gal; meeshaasaana laguugu
sheegi doonaa waxa ku saabsan waxyaalihii lagu amray
inaad samaysid oo dhan. **11** Markaan waxba arki waayay
dhalaalkii iftiinka aawadiis, kuwii ila joogay ayaa gacanta
igu hagay oo waxaan imid Dimishaq. **12** Oo mid la odhan
jiray Ananiyas, oo nin cibaadaysan ahaa sida sharcigu
leeyahay, oo ahaa mid Yuhuuddii halkaas joogtay oo dhanba
marag wanaagsan u furtay, **13** ayaa ii yimid oo iskay ag
taagay isagoo igu leh, Walaal Sawlosow, araggaaga hel.
Oo saacaddiiba waan arkay isagii. **14** Markaasuu igu yidhi,
Ilaaha awowayaasheen ayaa ku doortay inaad doonistiisa
ogaatid, iyo inaad Kan Xaqa ah aragtid oo aad afkiisa cod
ka maqashid. **15** Maxaa yeelay, dadka oo dhan hortiisa
waxaad isaga uga markhaati furaysaa waxaad aragtay oo
aad maqashay. **16** Haddaba maxaad u sugaysaa? Kac
ha lagu baabtiiso, oo dembiyadaada iska maydh, adoo
magiciisa ku baryaya. **17** Oo waxaa dhacday, markaan
Yeruusaalem ku soo noqday dabadeed, intaan macbudka
ku tukanayay, inaan riyooday, **18** oo waxaan arkay isagoo
igu leh, Degdeg, oo dhaqso Yeruusaalem uga bax; maxaa
yeelay, markhaatigaad ii furaysid kaama ay aqbali doonaan.
**19** Markaasaan idhi, Rabbiyow, iyaga qudhoodu way og yihiin
inaan xidhxidhay oo aan sunagog walba ku garaacay kuwa
ku rumaystay; **20** oo markii la daadshay dhiigga Istefanos
oo ahaa markhaatigaaga, aniguna waan ag taagnaa oo u
oggolaanayay oo haynayay kuwii isagii dilay dharkoodii.
**21** Markaasuu igu yidhi, Tag, maxaa yeelay, waxaan kuu
dirayaa meel fog inaad dadka aan Yuhuudda ahayn ugu
tagtid. **22** Wayna dhegaysteen ilaa hadalkaas; markaasay
codkoodii sare u qaadeen iyagoo leh, Dhulka ka fogee ninka
caynkan ah, maxaa yeelay, ma qummana inuu noolaado. **23**
Oo markay qaylinayeen oo dharka iska xoorayeen oo siigo
hawada ku tuurayeen, **24** ayaa sirkaalkii sare wuxuu amray
in isagii qalcaddii la soo geliyo, oo wuxuu u sheegay in
karbaash lagu imtixaamo si uu ku ogaado sababtii ay sidaas
ugu qaylinayeen isagii. **25** Oo markay suumanka ku xidheen
dabadeed ayaa Bawlos wuxuu ku yidhi boqol-u-taliyihii oo
ag taagnaa, Ma qaynuun baa inaad karbaashtaan nin reer
Rooma ah oo aan la xukumin? **26** Markii boqol-u-taliyihii
taas maqlayna, wuxuu u tegey sirkaalkii sare oo u sheegay,
isagoo leh, Maxaad samaynaysaa? Waayo, ninkanu waa
nin reer Rooma ah. **27** Markaasaa sirkaalkii sare u yimid
oo ku yidhi isagii, Ii sheeg, ma nin reer Rooma ah baad
tahay? Markaasuu yidhi, Haah. **28** Kolkaasaa sirkaalkii sare
u jawaabay oo ku yidhi, Waddaninimadan waxaan siistay
lacag badan. Laakiin Bawlos wuxuu ku yidhi, Anigu reer
Rooma ayaan u dhashay. **29** Haddaba kuwii doonayay inay
isagii imtixaamaan markiiba way ka tageen, xataa sirkaalkii
sarena waa cabsaday markuu ogaaday inuu yahay reer
Rooma, maxaa yeelay, wuu xidhay. **30** Laakiin maalintii
dambe, isagoo doonaya inuu hubsado waxa Yuhuuddu ku
dacwaysay, ayuu isagii furay, oo wuxuu wadaaddadii sare
iyo shirka oo dhan ku amray inay isu yimaadaan, markaasuu
Bawlos hoos u keenay oo soo hor taagay iyagii.

**23** Markaasaa Bawlos shirka aad u fiiriyey oo ku yidhi,
Walaalayaalow, ilaa maalintan ayaan qalbi wanaagsan
ku noolaa Ilaah hortiis. 2 Kolkaasaa wadaadkii sare oo
Ananiyas la odhan jiray ku amray kuwii ag taagnaa inay
afka ku dhuftaan. 3 Markaasaa Bawlos ku yidhi, Ilaah
baa kugu dhufan doona, kaaga derbi caddaysanow; ma
waxaad u fadhidaa inaad sharciga igu xukuntid oo aad
ku amartid in laygu dhufto si aan sharcigu lahayn? 4
Markaasaa kuwii ag taagnaa waxay ku yidhaahdeen, Ilaah
wadaadkiisa sare miyaad caayaysaa? 5 Bawlosna wuxuu
ku yidhi, Walaalayaalow, anigu ma aan garanaynin inuu
wadaadkii sare yahay; maxaa yeelay, waxaa qoran, Waa
inaanad wax shar ah kaga hadlin nin dadkaaga u taliya. 6
Laakiin Bawlos markuu gartay in dadka qaarkiis Sadukiin
yahay, qaarka kalena ay Farrisiin yihiin, ayuu shirkii ka dhex
qayliyey oo yidhi, Walaalayaalow, anigu waxaan ahay Farrisi
oo ah Farrisiinta wiilkood, oo wax ku saabsan rajada iyo
sarakicidda kuwii dhintay ayaa laygu xukumayaa. 7 Oo
markuu sidaas yidhina, waxaa Farrisiintii iyo Sadukiintii
ka dhex dhacay muran, ururkiina waa kala qaybsamay. 8
Maxaa yeelay, Sadukiintu waxay yidhaahdaan, Ma jiraan
sarakicidda ama malaa'ig ama ruuxba; laakiin Farrisiintu
kulligoodba way qirtaan. 9 Markaasaa waxaa dhacay buuq
weyn, oo qaar ka mid ah culimmadii safka Farrisiinta ayaa
istaagay iyagoo hadal ku dagaallamaya oo leh, Ninkan wax
shar ah kama helin; laakiin haddii ruux la hadlay isagii ama
malaa'ig la hadashay, Ilaah la dagaallami mayno. 10 Oo
markii muran weyni dhacay, ayaa sirkaalkii sare wuxuu
ka cabsaday inay Bawlos kala jeexjeexaan, markaasuu
askartii ku amray inay hoos tagaan oo xoog isaga uga soo
qaadaan dadka dhexdiisa, oo ay qalcaddii keenaan. 11
Haddaba habeenkii dambe Rabbiga ayaa is-ag taagay isagii
oo ku yidhi, Kalsoonow, maxaa yeelay, sidaad Yeruusaalem
iigu markhaati furtay waa inaad Roomana iigu markhaati
furtid. 12 Oo markii ay maalin noqotayna, ayaa Yuhuuddii
urur samaysteen oo nidar wada galeen iyagoo leh, Waxba
cuni mayno, waxbana cabbi mayno ilaa aan Bawlos dilno
mooyaane. 13 Kuwa isku dhaartayna waxay ka badnaayeen
afartan. 14 Markaasay u yimaadeen wadaaddadii sare iyo
waayeelladii, oo waxay ku yidhaahdeen, Nidar weyn ayaannu
wada galnay, oo waxaannu isku dhaarsannay inaannan
waxba dhadhamin ilaa aannu Bawlos dilno. 15 Haddaba
idinka iyo shirkuba waxaad sirkaalka sare garansiisaan
inuu isagii idiin keeno sidii idinkoo doonaya inaad aad u sii
garataan waxyaalaha ku saabsan isagii; annaguna, intuusan
soo dhowaan, diyaar baannu nahay inaannu dilno isagii.
16 Laakiin Bawlos wiilkuu abtiga u ahaa wuxuu maqlay
gaadmadoodii, markaasuu yimid oo qalcaddii galay oo
Bawlos u warramay. 17 Markaasaa Bawlos wuxuu u yeedhay
boqol-u-taliyayaashii midkood oo ku yidhi, Wiilkan u gee
sirkaalka sare, maxaa yeelay, war buu qabaa inuu u sheego.
18 Sidaas daraaddeed ayuu kaxeeyey oo u geeyey sirkaalkii
sare oo ku yidhi, Bawlos oo maxbuuska ah ayaa ii yeedhay,
oo wuxuu i weyddiistay inaan kuu keeno wiilka oo war qaba
inuu kuu sheego. 19 Markaasaa sirkaalkii sare gacanta
ku qabtay isagii oo gees ula leexday oo gooni ahaan u
weyddiiyey isagoo leh, Waa maxay warkaad qabtaa inaad
ii sheegtid? 20 Markaasuu ku yidhi, Yuhuuddu waxay ku
heshiiyeen inay kuu weyddiistaan inaad berrito Bawlos shirka
hor keentid sidii adigoo doonaya inaad u sii weyddiisatid
wax ku saabsan isagii. 21 Haddaba yaanay ku oggolaysiin;
maxaa yeelay, waxaa isagii gaadaya kuwa ka badan afartan
nin oo iyaga ka mid ah, kuwaasoo nidar galay inayan wax
cunin, waxna cabbin ilaa ay isaga dilaan; haddana diyaar
bay yihiin, iyagoo ballanqaad kaa filanaya. 22 Haddaba
sirkaalkii sare wiilkii buu iska diray isagoo ku amraya oo
leh, Ninna ha u sheegin inaad waxyaalahan ii muujisay.
23 Markaasuu wuxuu u yeedhay laba ka mid ah boqol-u-
taliyayaashii oo ku yidhi, Waxaad diyaarisaan inay saddexda
saacadood oo habeennimo tagaan ilaa Kaysariya laba boqol
oo askar ah iyo toddobaatan fardooley ah iyo laba boqol oo
warmooley ah. 24 Wuxuu kaloo ku yidhi, Keena neefaf ay
Bawlos fuuliyaan oo nabad isaga ugu geeya taliye Feelikos.
25 Markaasuu qoray warqad sidan ah: 26 Kalawdiyos Lusiyas
wuxuu salaamayaa taliyaha sharafka weyn leh oo Feelikos
ah. 27 Markii Yuhuuddu qabatay ninkan oo ay u dhowaayeen
inay dilaan, ayaan askar la imid oo bixiyey, markaan ogaaday
inuu reer Rooma yahay. 28 Anigoo doonaya inaan ogaado
sababtii ay ku dacwaynayeen, ayaan isagii shirkoodii hor
keenay; 29 kaasoo aan markaas gartay inay isaga ku
dacweeyeen su'aalo ku saabsan sharcigooda, laakiin inaan
lagu ashtakayn wax uu ku istaahilo in la dilo ama in la
xidho. 30 Haddaba markii la ii sheegay in loo heshiiyey in
ninkii la gaadi doono, ayaan dhaqso kuugu soo diray isagii,
anigoo ku amraya kuwii soo dacwaynayay inay hortaada ku
dacweeyaan isaga. 31 Sidaas daraaddeed ayaa askartii, sidii
lagu amray, Bawlos kaxeeyeen, oo habeennimo keeneen
Antibatris. 32 Laakiin maalintii dambe ayay fardooleydii
daayeen inay isaga sii raacaan, iyaguna waxay ku noqdeen
qalcaddii; 33 kuwaasu markay Kaysariya yimaadeen oo ay
warqaddii u dhiibeen taliyaha, ayay Bawlos hor taageen
isagii. 34 Markuu akhriyeyna, wuxuu weyddiiyey gobolkii uu
ka yimid; oo kolkuu ogaaday inuu Kilikiya ka yimid, 35 ayuu
wuxuu ku yidhi, Waan maqli doonaa dacwadaada markii

kuwii ku dacwaynayay yimaadaan; markaasuu ku amray in
lagu hayo gurigii taliyaha.

**24** Kolkaasaa shan maalmood dabadeed waxaa yimid
Ananiyas oo ahaa wadaadkii sare oo wata kuwo
waayeellada ah iyo mid codkar ah oo Tertullos la odhan jiray;
oo waxay taliyihii u sheegeen wax Bawlos ka gees ah. 2 Oo
markii loo yeedhay ayaa Tertullos wuxuu bilaabay inuu isagii
dacweeyo, oo wuxuu yidhi, Adiga daraaddaa waxaannu ku
raaxaysannaa nabad badan, oo dhaqaalahaaga aawadiisna
xumaatooyinka waa laga hagaajiyaa quruuntan. 3 Annaguna
si walba iyo meel walba ayaannu ku aqbalnaa, adigan
Feelikos ah oo sharafka weyn lahow, oo aad iyo aad
ayaannu ugu mahadnaqaynaa. 4 Laakiin si aanan kuu sii
daalin, waxaan kaa baryayaa inaad raxmaddaada nooga
maqashid dhawr eray. 5 Maxaa yeelay, waxaannu aragnay in
ninkanu yahay nin baas oo fidmad ka dhex kiciya Yuhuudda
dunida joogta oo dhan, waana kan horgalaha u ah dariiqada
Naasaraaniyiinta; 6 oo wuxuu aad ugu dadaalay inuu
macbudka nijaaseeyo; oo weliba annagu waan soo qabannay
isagii, oo waxaannu ku xukumi lahayn wax sharcigayaga ku
saabsan. 7 Laakiin waxaa yimid sirkaalkii sare oo Lusiyas la
yidhaahdo, oo gacantayada xoog kaga baxshay isagii, 8
oo wuxuu kuwii soo dacwaynayay ku amray inay hortaada
yimaadaan. Isaga markaad adiga qudhaadu imtixaantid
waad ka ogaan kari doontaa waxyaalahan aannu isaga ku
dacwaynayno oo dhan. 9 Oo Yuhuuddiina way ku darmadeen
dacwadii iyagoo adkaynaya in waxyaalahaasu saas yihiin.
10 Oo markii taliyuhu u gacan haadiyey inuu hadlo, ayaa
Bawlos u jawaabay oo wuxuu yidhi. Anigu waan ogahay
inaad sannado badan quruuntan xaakin u ahayd, sababtaas
daraaddeed anigoo aad u faraxsan ayaan isdaafacayaa.
11 Adigu waad ogaan karaysaa inayan laba iyo toban
maalmood ka badnayn kolkii aan Yeruusaalem caabudidda
u tegey. 12 Anigoo qof la doodaya ama dad badan kicinaya
laygama helin ama macbudka ama sunagogyada ama
magaalada. 13 Kuumana ay caddayn karaan waxyaalihii
ay imminka igu dacwaynayaan. 14 Laakiin tan baan kuu
qiranayaa, inaan Ilaaha awowayaashayo ugu adeego sida
Jidka ay yidhaahdaan dariiqo bidcinimo ah, anigoo rumaysan
waxyaalaha sharcigu leeyahay oo dhan iyo waxyaalaha lagu
qoray kitaabbadii nebiyada. 15 Oo waxaan xagga Ilaah ka
rajaynayaa waxyaalaha ay kuwan qudhooduba filanayaan,
waana inay jiri doonto sarakicidda ay kuwa xaqa ah iyo kuwa
aan xaqa ahayn soo sara kici doonaan. 16 Tan ayaan ku
dadaalayaa inaan had iyo goorba qabo qalbi aan xumaan u
keenin xagga Ilaah iyo xagga dadba. 17 Haddaba sannado
badan dabadeed ayaan waxaan u imid inaan quruuntayda
u keeno sadaqooyin iyo qurbaanno. 18 Markaan kuwaas
keenayay ayay macbudka iga heleen, anigoo daahirsamay,
oo aan dad badan la joogin, oo aan buuq ku jirin; laakiin
waxaa joogay kuwo Yuhuud ah oo Aasiya ka yimid 19
kuwaasoo ay waajib ahayd inay halkan hortaada joogaan
oo ay i dacweeyaan haddii ay wax igu haystaan. 20 Haddii
kalese nimankan qudhoodu ha sheegeen xaqdarradii ay igu
heleen markii aan shirka hor istaagay, 21 haddii ayan ahayn
codkan keliya oo aan ku dhawaaqay markaan iyaga dhex
taagnaa oo idhi, Wax ku saabsan sarakicidda kuwii dhintay
ayaad maanta igu xukumaysaan. 22 Laakiin Feelikos oo
aad u sii garanaya wax ku saabsan Jidka ayaa xaajadoodii
dib u dhigay oo yidhi, Kolkii sirkaalka sare oo Lusiyas ah
yimaado ayaan xaajadiinna dhammaan u garan doonaa. 23
Markaasuu boqol-u-taliyihii ku amray in la ilaaliyo isagoo aan
xidhnayn oo aan saaxiibbadiis laga joojin inay u adeegaan.
24 Laakiin dhawr maalmood dabadeed ayaa Feelikos yimid
isagoo ay naagtiisa Darusilla oo Yahuudiyad ahayd la socoto,
oo wuxuu u cid dirsaday Bawlos, oo wuxuu ka maqlay wax
ku saabsan rumaysadkuu rumaystay Ciise Masiix. 25 Oo
intuu kala hadlayay xaqnimada iyo iscelinta iyo xukunka
imanaya, ayaa Feelikos cabsaday oo u jawaabay oo ku yidhi,
Haatan iska tag; oo markaan wakhti wanaagsan helo ayaan
kuu yeedhan doonaa. 26 Wuxuu rajaynayay in Bawlos lacag
siiyo isagii, sidaas daraaddeed ayuu marar badan u soo cid
diray oo la hadlay isagii. 27 Laakiin markii laba sannadood
dhammaatay waxaa Feelikos jagadiisa qaatay Borkiyos
Feestos; Feelikosna isagoo doonaya inuu Yuhuuddii ka
farxiyo ayuu Bawlos daayay isagoo xidhan.

**25** Haddaba Feestos markuu soo galay gobolkii, ayuu
saddex maalmood dabadeed Kaysariya ka tegey, oo
wuxuu aaday Yeruusaalem. 2 Markaasaa wadaaddadii sare
iyo raggii Yuhuudda u waaweynaa waxay isagii u sheegeen
wax Bawlos ka gees ah, wayna baryeen 3 oo axsaan ka
weyddiisteen inuu isaga Yeruusaalem u soo diro; iyagoo
shirqool u dhigaya inay jidka ku dilaan. 4 Habase yeeshee
Feestos wuxuu ugu jawaabay in Bawlos lagu dhawrayo
Kaysariya, iyo in isaga qudhiisuba dhaqsiyo halkaas u
aadayo. 5 Oo wuxuu ku yidhi, Haddaba kuwa idinku jira oo
amarka lahu aniga ha ila tageen, oo haddii ninkaasu wax
qallooc ah leeyahay, iyagu ha dacweeyeen isaga. 6 Oo
markuu iyagii dhex joogay in aan ka badnayn siddeed ama
toban maalmood, ayuu wuxuu aaday Kaysariya, kolkaasuu
maalintii dambe fadhiistay kursigii xukumaadda, oo wuxuu
amray in Bawlos la keeno. 7 Oo kolkuu yimid, Yuhuuddii

Yeruusaalem ka timid ayaa hareerihiisii soo istaagtay,
oo waxay keeneen dacwooyin badan oo waaweyn, oo
ayan iyagu xaqiijin karin. 8 Markii Bawlos isdaafacayay,
ayuu wuxuu yidhi, Anigu innaba kuma dembaabin sharciga
Yuhuudda ama macbudka iyo Kaysar toona. 9 Laakiin
Feestos isagoo doonaya inuu Yuhuudda kaga farxiyo, ayuu
wuxuu ku jawaabay oo Bawlos ku yidhi, Ma doonaysaa
inaad Yeruusaalem tagto oo waxyaalahan halkaas hortayda
lagugu xukumo? 10 Laakiin Bawlos wuxuu yidhi, Anigu
waxaan hor taaganahay kursigii xukumaadda oo Kaysar;
halkanay igu waajib tahay in laygu xukumo. Anigu Yuhuudda
innaba xumaan kuma aan samayn, sidaad aad ugu og tahay.
11 Haddaba haddii aan xumaan falay oo aan galay wax
dhimasho istaahila, geeri diidi maayo; laakiin waxyaalahan ay
kuwanu igu dacwaynayaan haddii aan wax run ah lagu arag,
ninna iima gacangelin karo iyaga. Waxaan u ashtakoonayaa
Kaysar. 12 Markaasaa Feestos, markuu shirka la tashaday,
ayuu wuxuu ku jawaabay, Kaysar baad u ashtakootay;
Kaysar baad u tegaysaa. 13 Haddaba kolkii dhawr maalmood
la soo dhaafay ayaa waxaa Kaysariya yimid oo Feestos soo
salaamay boqor Agribba iyo Bernikee. 14 Oo kolkii ay maalmo
badan halkaas joogeen ayaa Feestos wuxuu boqorkii hor
dhigay dacwadii Bawlos, oo wuxuu ku yidhi, Waxaa jira nin
Feelikos ka tegey isagoo maxbuus ah; 15 kaasoo waagii aan
Yeruusaalem joogay ay wadaaddadii sare iyo waayeelladii
Yuhuuddu igu soo dacweeyeen iyagoo doonaya in la xukumo
isagii. 16 Iyagii waxaan ugu jawaabay oo ku idhi, Ma aha
caadada reer Rooma in ninna xukumaad loo dhiibo intaan
mudduciyaasha laysku hor keenin muddacalayga oo la
siin fursad uu isaga daafaco xaalka lagu ashtakeeyey. 17
Haddaba markii ay halkan wada yimaadeen, anigu innaba
siima aan raagin ee maalintii dambe ayaan waxaan ku
fadhiistay kursigii xukumaadda, oo waxaan amray in ninka la
keeno. 18 Laakiin markii ay mudduciyaashii istaageen, ma
ay keenin innaba wax xumaan ah oo u eg wixii aan filanayay;
19 laakiin waxay lahaayeen su'aalo isaga ka gees ah oo ku
saabsan diintooda iyo mid Ciise la odhan jiray oo dhintay,
laakiin Bawlos leeyahay inuu nool yahay. 20 Haddaba anigoo
ka shakiyaya sidii aan waxyaalahan u sii haybin lahaa, ayaan
waxaan isagii weyddiistay bal inuu Yeruusaalem tegayo oo
meeshaas lagu xukumo waxyaalahan iyo in kale. 21 Laakiin
markii Bawlos doonayay in la sii hayo ilaa boqorku gar gooyo,
waxaan amray in la sii hayo ilaa aan isaga Kaysar u diro. 22
Markaasaa Agribba wuxuu Feestos ku yidhi, Aniguba waxaan
jeclaan lahaa inaan ninka maqlo. Markaasuu yidhi, Berritaad
maqlaysaa. 23 Sidaas daraaddeed maalintii dambe ayaa
Agribba iyo Bernikee waxay la yimaadeen bandhig weyn, oo
waxay soo galeen maxkamaddii, iyaga iyo nimankii sare
iyo raggii magaalada ugu waaweynaa. Markaasaa Feestos
wuxuu amray in Bawlos loo keeno. 24 Markaasaa Feestos
wuxuu yidhi, Boqor Agribba iyo ragga kale oo halkan nala
jooga oo dhammow, waxaad arkaysaan ninkan Yuhuudda
badan oo dhammu ay iiga soo cabteen Yeruusaalem iyo
halkanba, iyagoo ku qaylinaya, Waajib ma aha in ninkanu
sii noolaado. 25 Laakiin waxaan ogaaday inuusan samayn
innaba wax dhimasho istaahila; oo isaga qudhiisuba wuxuu
u ashtakooday boqorka, sidaas daraaddeed waxaan goostay
inaan isaga diro. 26 Haddaba anigu ma hayo wax xaqiiqa ah
oo ninkan ku saabsan oo aan sayidkayga u qoro. Sidaas
daraaddeed ayaan isaga hortiinna u keenay, iyo khusuusan
adiga hortaada, boqor Agribbow, in kolkii loo imtixaamo
dabadeed aan helo wax aan qoro. 27 Waayo, waxay ila eg
tahay caqliyaraan in maxbuus la diro iyadoo aan aad loo
xaqiijin wixii lagu ashtakeeyey.

**26** Markaasaa Agribba wuxuu Bawlos ku yidhi, Waa laguu
fasaxay inaad nafsaddaada u hadashid. Kolkaasaa
Bawlos gacantiisa fidiyey oo isdaafacay. 2 Boqor Agribbow,
waxaan isku tirinayaa mid faraxsan inaan maanta hortaada
isaga daafaco waxyaalihii ay Yuhuuddu igu soo dacweeyeen
oo dhan; 3 maxaa yeelay, adigu waxaad khusuusan
xariif ku tahay caadooyinka iyo su'aalaha oo dhan oo
Yuhuudda dhex yaalla; haddaba waxaan kaa baryayaa
inaad ii dulqaadatid oo aad i maqashid. 4 Yuhuuddu
dhammaantoodba tan iyo yaraantaydii way wada yaqaaniin
camalka noloshayda, taasoo bilowga aan kula dhex jiray
quruuntayda oo aan Yeruusaalem la joogay. 5 Haddii ay
raalli ku yihiin inay ii marag furaan, iyaguba tan iyo horraantii
aqoon bay u lahaayeen sidii aan ugu dhaqmi jiray dariiqada
diintayada ugu qiiro adag anoo Farrisi ah. 6 Haddaba
waxaan haatan halkan u taaganahay in la ii xukumo rajadii
ballankii Ilaah u qaaday awowayaashayo. 7 Oo laba iyo
tobankayaga qabiilba waxay Ilaah aad ugu adeegaan habeen
iyo maalinba iyagoo rajaynaya in ay ballankaas helaan.
Haddaba boqorow, Yuhuuddu waxay igu ashtakeeyeen
wax rajadaas ku saabsan! 8 Haddii Ilaah kuwii dhintay
soo sara kiciyo, bal maxaad ugu qaadataan wax aan la
rumaysan karin? 9 Runtii aniga qudhayduba waxaan mooday
inay waajib igu tahay inaan sameeyo waxyaalo badan oo
wada khilaafsan magaca Ciisaha reer Naasared. 10 Oo
sidaasaan ku sameeyey Yeruusaalem; weliba waxaan xabsi
ku xidhay kuwo badan oo quduusiin ah, anigoo amar ka wata
wadaaddada sare, oo kolkii la dilayayba waan ku raacsanaa.
11 Oo marar badan ayaan iyaga ku ciqaabay sunagogyada

oo dhan, oo waxaan qasbay inay caytamaan; oo intaan
aad iyo aad ugu cadhooday, ayaan iyaga ku silciyey tan
iyo xataa magaalooyin ajanabi. 12 Oo markaan Dimishaq u
sodcaalayay, boqorow, anigoo wata amarkii iyo dardaarankii
wadaaddada sare, 13 ayaan waxaan hadhkii arkay, intaan
jidka marayay, iftiin samada ka baxaya oo qorraxda ka sii
dhalaal dheer, oo ka iftiimaya hareerahayga aniga iyo kuwii
ila socdayba. 14 Oo kolkii aannu dhammaantayo dhulka ku
wada dhacnay, ayaan maqlay cod afka Cibraaniga ku hadlaya
oo igu leh, Sawlosow, Sawlosow, maxaad ii silcinaysaa?
Way kugu adag tahay inaad harraatidid wax ku muda. 15
Markaasaan idhi, Yaad tahay Sayidow? Kolkaasaa Rabbigu
wuxuu igu yidhi, Waxaan ahay Ciisaha aad silcinaysid. 16
Laakiin bal sara joogso, oo cagahaaga ku istaag; waayo,
sababtan aawadeed ayaan kuugu muuqday inaan kaaga
dhigo midiidin iyo markhaati waxyaalihii aad igu aragtay iyo
waxyaalaha aan kuugu muuqan doonaba; 17 anigoo kaa
samatabbixinaya dadka iyo quruumaha aan kuu diri doonaba,
18 inaad indhahooda furtid si ay gudcur uga soo jeestaan
oo ay iftiinka ugu soo jeestaan, iyo inay ka soo leexdaan
xoogga Shayddaanka oo ay Ilaah u yimaadaan, inay helaan
dembidhaaf oo ay dhaxal la helaan kuwa quduus lagaga
dhigay rumaysadka ay igu leeyihiin. 19 Sidaas daraaddeed,
boqor Agribbow, kuma aan caasiyoobin riyadii samada ka
timid; 20 laakiin waxaan horeba ugu sheegay kuwii joogay
Dimishaq iyo Yeruusaalem iyo dalka Yahuudiya oo dhan iyo
weliba dadka aan Yuhuudda ahayn, inay toobadkeenaan
oo ay Ilaah u soo noqdaan, iyagoo samaynaya shuqullo
toobad istaahila. 21 Waxyaalahaas aawadood baa Yuhuuddu
macbudka gudihiisa iigu qabteen, oo waxay isku dayeen
inay i dilaan. 22 Haddaba anigoo caawimaad ka helay
xag Ilaah ayaan waxaan ilaa maanta u taaganahay inaan
marag furo oo aan u sheego yar iyo weynba, anigoo aan
innaba wax kale sheegayn wixii nebiyadii iyo Muuse ay sii
sheegeen inay ahaan doonaan mooyaane; 23 taasoo ah in
Masiixu xanuunsan doono, iyo sida isagoo ah kii kowaad oo
kuwii dhintay ka soo sara kacay uu iftiin ugu naadin doono
dadka iyo quruumahaba. 24 Oo intuu saas isu daafacayay,
ayaa Feestos cod weyn ku dhawaaqay oo yidhi, Bawlosow,
waad waalan tahay. Barashadaadii badnayd ayaa waalli kuu
beddeshay. 25 Laakiin Bawlos wuxuu yidhi, Feestoskii aad
u sarreeyeyow, anigu ma aan waalni, laakiin waxaan ku
hadlayaa erayo run ah iyo feeyignaan. 26 Waayo, boqorka
aan ikhtiyaar ula hadlayaa wuu garanayaa waxyaalahan;
waayo, anigu waxaan hubaa inaan waxyaalahan midkoodna
uusan isaga ka qarsoonayn; waayo, waxyaalahan laguma
samayn meel qarsoon. 27 Boqor Agribbow, nebiyadii ma
rumaysan tahay? Waan ogahay inaad rumaysan tahay. 28
Markaasaa Agribba wuxuu Bawlos ku yidhi, Wax yar baad
igu oggolaysiinaysaa inaan Masiixi noqdo. 29 Kolkaasaa
Bawlos wuxuu yidhi, Waxaan Ilaah ka dooni lahaa in, haddii
ay tahay wax yar iyo haddii ay tahay wax badan, ayan
ahayn adiga oo keliya, laakiin in, inta maanta i maqlaysaa
oo dhammu, ay wada noqdaan sida aan ahay oo kale,
silsiladahan mooyaane. 30 Markaasaa boqorkii kacay iyo
taliyihii iyo Bernikee iyo kuwii la fadhiyey oo dhammu; 31
oo kolkii ay baxeen ayaa midba midkii kale la hadlay, oo
waxay isku yidhaahdeen, Ninkanu innaba ma uu samayn
wax istaahila dhimasho iyo silsilado toona. 32 Markaasaa
Agribba wuxuu Feestos ku yidhi, Ninkan waa la sii dayn kari
lahaa haddii uusan Kaysar u ashtakoon.

**27** Haddaba markii la goostay inaannu Itaaliya u dhoofo
ayaa Bawlos iyo dhawr kale oo maxaabiis ah waxaa
loo dhiibay boqol-u-taliye magiciisa Yulyos la odhan jiray oo
ka tirsanaa ciidankii boqorka. 2 Oo waxaannu fuulnay doonni
Adramuteyon ka timid oo u dhoofaysay meelaha xeebta
Aasiya ku yaal, markaasaannu dhoofnay oo waxaa nala
socday nin Aristarkhos la odhan jiray oo reer Makedoniya
ahaa oo Tesaloniika ka yimid. 3 Oo maalintii dambe
waxaannu nimid Siidoon; markaasaa Yulyos u naxariistay
Bawlos oo fasax u siiyey inuu saaxiibbadiis u tago oo
uu dhaqaalo ka helo. 4 Oo haddana halkaas waannu ka
dhoofnay, oo waxaannu ka hoos marnay Qubrus, maxaa
yeelay, dabayshu waa na haysay. 5 Oo markii aannu ka
gudubnay badda u dhow Kilikiya iyo Bamfuliya, waxaannu
nimid Mura oo ku taal Lukiya. 6 Oo halkaas boqol-u-taliyihii
wuxuu ka helay doonni Iskanderiya ka timid oo u dhoofaysa
Itaaliya; markaasuu na fuushiiyey. 7 Oo kolkii aannu maalmo
badan aayar soconaynay, waxaannu dhib ku nimid Kinidos
horteeda, oo dabayshii ayaa noo diiday inaan hore u sii
soconno, kolkaasaannu ka hoos marnay Kereetee oo ka hor
jeedda Salmoonee. 8 Oo markii aannu dhib ku dhaafnay,
waxaannu nimid meel magaceeda la yidhaahdo Marsooyin
Wanaagsan oo u dhow magaalada Lasaya. 9 Markii wakhti
badanu dhammaaday, oo haatan dhoofku halis ahaa, maxaa
yeelay, Soonkii goor horaa la soo dhaafay, ayaa Bawlos
waaniyey iyagii, 10 oo wuxuu ku yidhi, Niman yahow, waxay
ila tahay in dhoofkanu lahaan doono waxyeello iyo khasaaro
badan, umana ahaan doonaan shixnadda iyo doonnida
oo keliya, laakiin xataa nafaheennu khatar bay ku sugan
yihiin. 11 Laakiin boqol-u-taliyihii wuxuu dhegaystay hadalkii
naakhudihii iyo ninkii doonnida lahaa intuu dhegaysan lahaa
waxyaalihii Bawlos yidhi. 12 Oo marsadaasu ma ay ahayn
mid ku wanaagsan in wakhtiga qabowga la joogo, sidaas

daraaddeed ayaa dadkii intiisii badnayd waxay ku talisay
in halkaas laga sii dhoofo, haddii si uun lagu gaadhi karo
Foynikis oo halkaas wakhtiga qabowga la joogo, taasoo ah
marso Kereetee ku taal oo u jeedda woqooyi-bari iyo koonfur-
bari. 13 Oo kolkii dabayshii koonfureed tartiib u socotay
ayay waxay u maleeyeen inay qasdigoodii heleen, kolkaasay
barroosinkii qaadeen, oo waxay ag mareen Kereetee. 14
Laakiin wakhti aan dheerayn dabadeed ayaa waxaa ka soo
kacay duufaan weyn oo magiciisa la yidhaahdo Yurokludoon;
15 oo markii doonnidii la qabsaday oo ay wejiga siin kari
weyday dabaysha, ayaannu iska dhiibnay, kolkaasay na
kaxaysatay. 16 Oo waxaannu ku orodnay gasiirad yar
oo Kalawda la yidhaahdo dugsigeed, oo annagoo aad u
dhibtoonnay ayaan waxaan awood u helnay inaan huurigii
aad u xidhno; 17 Oo kolkii ay kor u soo bixiyeen ayay
waxay ku isticmaaleen xadhko wax tara oo doonnidiina
way adkeeyeen, oo iyagoo ka cabsanaya inay Surtis oo
bacaad ah ku dhacaan, ayay waxay dejiyeen shiraaqii,
oo sidaasaa loo kaxaystay. 18 Oo sidii aannu duufaankii
aad ugu hawshoonaynay, ayay maalintii dambe shixnaddii
badda ku tuureen. 19 Oo maalintii saddexaadna waxay
gacmahoodii ku tuureen alaabtii doonnida. 20 Oo markii
intii maalmo badan ah ayan qorraxdii iyo xiddigihii toona
ifin, oo duufaan aan yaraynuna uu nagu dhacayay, ayaa
rajadii aannu badbaado ku rajaynaynay oo dhan nalaga
qaaday. 21 Oo kolkii ay wakhti dheer cuntola'aan sii joogeen
ayaa Bawlos dhexdooda istaagay, oo wuxuu ku yidhi, Niman
yahow, waxaa idinku habboonayd inaad i maqashaan oo
aydaan Kereetee ka soo dhoofin oo helin waxyeelladan iyo
khasaaradan toona. 22 Haddaba waxaan idinku waaninayaa
inaad kalsoonaataan; waayo, midkiinna nafta waayi maayo,
laakiin waxaa keliyahoo dumaya doonnida. 23 Waayo,
xalayto ayaa waxaa i soo ag istaagtay malaa'igtii Ilaaha i leh
oo aan weliba u adeego. 24 Waxay igu tidhi, Bawlosow, ha
cabsan; waayo, waa inaad Kaysar hortiisa istaagtaa; oo
weliba bal eeg, Ilaah wuxuu adiga ku wada siiyey kuwa kula
socda oo dhan. 25 Haddaba, niman yahow, kalsoonaada,
waayo, anigu Ilaah waan rumaysanahay inay noqon doonto
sidii la ii sheegay. 26 Habase yeeshee waa inaynu ku dhacno
gasiirad. 27 Laakiin intii badda Adriya hore iyo gadaal nalagu
kaxeeyey, kolkii habeenkii afar iyo tobnaad la gaadhay, goor
habeenbadhkii ku dhow, ayaa baxriyiintii waxay u maleeyeen
inay dhul ku soo dhowaanayeen; 28 kolkaasay moolkii badda
qiyaas ka qaadeen, oo waxay heleen inuu yahay labaatan
baac, oo haddana kolkay in yar socdeen ayay mar kale
qiyaas qaadeen, oo waxay heleen inuu yahay shan iyo toban
baac. 29 Waxay ka cabsadeen inaannu ku dhacno meelo
dhagaxyo leh, markaasay waxay doonnida xaggeeda dambe
ka tuureen afar barroosin, oo waxay aad u jeclaysteen in
maalin noqoto. 30 Oo baxriyiintii ayaa waxay damceen
inay doonnida ka baxsadaan, oo waxay badda qarsoodi
ugu dejiyeen huurigii sidii iyagoo barroosinno ka tuuraya
doonnidii xaggeeda hore. 31 Markaasaa Bawlos boqol-u-
taliyihii iyo askartii ku yidhi, Kuwanu haddayan doonnida sii
joogin, idinku badbaadi kari maysaan. 32 Markaasaa askartii
xadhkaha huuriga ka jareen oo ay huurigii sii daayeen inuu
dhaco. 33 Oo intii waagu soo beryayay, ayaa Bawlos wuxuu
dadkii oo dhan ka baryay inay wax cunaan, oo wuxuu yidhi,
Maanta waa maalintii afar iyo tobnaad intii aad sugayseen
oo aad iska soomanaydeen, oo aydnaan waxba qaadan. 34
Haddaba waxaan idinka baryayaa inaad cunto qaadataan,
waayo, taasu waa caafimaadkiinna aawadiis; maxaa yeelay,
midkiinna tin keliyahu ka go'i maayo madaxiisa. 35 Oo markii
uu saas yidhi, ayuu wuxuu soo qaatay kibis, oo dadkii oo
dhan hortooda ayuu Ilaah ugu mahadnaqay, oo intuu kala
jebiyey ayuu bilaabay inuu wax cuno. 36 Markaasay wada
dhiirranaadeen dhammaantood, oo iyagiina wax bay cuneen.
37 Oo intayadii doonnidii ku jirtay oo dhammu waxaannu
ahayn laba boqol iyo lix iyo toddobaatan qof. 38 Oo markii
ay cuntada ka dhergeen, ayay doonnidii fududeeyeen,
oo sarreenkiina waxay ku tuureen badda. 39 Oo markii
waagii beryay, ayay dhulkii garan waayeen; laakiin waxay
arkeen marso xeeb leh, oo waxay doonayeen inay doonnidii
halkaas ku kaxeeyaan hadday karaan. 40 Markaasay
barroosinnadii badda ku xooreen oo badda ku sii daayeen,
oo isla markaasba waxay fureen xadhkihii shukaanaha ku
xidhnaa, oo intay shiraaqii dabaysha u sii daayeen, ayay
xeebta ku hagaageen. 41 Laakiin waxay ku dhaceen meel
laba badood isaga darmadaan, markaasaa doonnidii dhulka
ku dhufatay; oo dhankeedii hore ayaa meel ku liimbaaday
oo waxay noqotay wax aan la dhaqdhaqaajin karin, laakiin
dhankii dambe wuxuu bilaabay inuu ku burburo mawjadihii
xooggooda. 42 Markaasaa askartii waxay ku taliyeen inay
maxaabiista laayaan, si aan midkoodna intuu dabaasho
uga baxsan. 43 Laakiin boqol-u-taliyihii oo doonayay inuu
badbaadiyo Bawlos, ayaa qasdigoodii ka joojiyey; oo wuxuu
amray in kuwa dabaalan karaa ay doonnida iska tuuraan, oo
ay marka hore dhulka tagaan; 44 oo inta kalena qaar ha ku
dabaasho looxaan, qaarna waxyaalo kale oo ay doonnida
ka sii qaataan. Oo sidaas daraaddeed waxay noqotay inay
dhammaantood dhulkii u baxsadeen iyagoo nabdoon.

**28** Oo kolkii aannu wada baxsannay ayaan ogaannay in
gasiiraddaas la yidhaahdo Melita. 2 Oo barbariyiintii

waxay na tuseen raxmad khaas ah; waayo, iyagu waxay
shideen dab, oo dhammaantayona way na soo dhoweeyeen,
sababtuna waa roobkii wakhtigaas jiray daraaddiis iyo
dhaxantii daraaddeed. 3 Laakiin Bawlos ayaa soo ururshay
xaabo badan, oo wuxuu saaray dabka, kolkaasaa kulaylka
daraaddiis waxaa soo baxay jilbis oo gacantiisuu ku dhegay.
4 Oo barbariyiintiina markay arkeen bahalkii gacantiisa
ka laalaaday ayaa midkoodba wuxuu mid kale ku yidhi,
Shakila'aan ninkanu waa nin dhiig qaba, waayo, in kastoo
uu baddii nabdoonaan kaga baxsaday, haddana xaqnimadu
uma oggolaan inuu sii noolaado. 5 Habase yeeshee bahalkii
ayuu dabka iskaga tuuray, oo innaba waxyeello ma gaadhin
isagii. 6 Laakiin iyagii waxay filanayeen inuu haddiiba bararo
ama uu markiiba dhaco isagoo meyd ah; laakiin kolkii ay
wakhti dheer dhawrayeen oo ay arkeen inaan waxyeello ku
dhicin isagii, ayay fikirradoodii beddeleen, oo waxay isku
yidhaahdeen, Isagu waa ilaah. 7 Haddaba meeshaas waxaa
u dhowaa dhulal uu leeyahay ninkii gasiiradda madaxda u
ahaa oo magiciisa la odhan jiray Bobliyos. Kaasuna waa
na soo dhoweeyey, oo intii saddex maalmood ah ayuu
si sharaf ah noo marti qaaday. 8 Oo waxay noqotay in
Bobliyos aabbihiis jiifsaday isagoo qandho iyo dabadhiig
qaba. Markaasaa Bawlos isagii u galay oo intuu u duceeyey
ayuu gacmihiisii saaray oo wuu bogsiiyey isagii. 9 Oo markii
waxaas la sameeyey dabadeed ayaa intii kale oo cudurro
qabtay oo gasiiraddii joogtay oo dhammu wada yimaadeen,
oo iyana waa la bogsiiyey; 10 oo kuwaasuna waxay nagu
sharfeen sharaf badan; oo markii aannu dhoofaynay ayay
doonnida noo saareen wax alla wixii aannu u baahnayn. 11
Saddex bilood dabadeed waxaannu ku dhoofnay doonni
Iskanderiya ka timid oo wakhtigii qabowga gasiiraddii joogtay
taasoo sumaddeedii ahayd Walaalihii Mataanaha ahaa. 12
Markaasaannu nimid Surakus, oo saddex maalmood ayaan
halkaas sii joognay. 13 Oo halkaasaannu ka wareegnay
oo waxaannu gaadhnay Regiyon; oo maalin dabadeed
waxaa kacday dabayl koonfureed, oo maalintii labaadna
waxaannu nimid Botiyolos. 14 Oo halkaas waxaan ka
helnay walaalo, oo waxay naga baryeen inaan toddoba
maalmood iyaga la sii joogno, oo sidaas ayaan Rooma
ku nimid. 15 Oo halkaasna walaalihii markii ay maqleen
warkayagii, ayay u soo baxeen inay naga hor yimaadaan, oo
waxay soo gaadheen tan iyo Suuqa Abbiyus iyo Saddexdii
Makhaayadood. Oo Bawlosna markuu arkay iyagii ayuu
Ilaah ku mahadnaqay oo sii dhiirranaaday. 16 Oo markii
aannu Rooma galnay ayaa Bawlos waxaa loo oggolaaday
inuu keli ahaantiis u joogo isaga iyo askarigii dhawrayay.
17 Oo waxay noqotay in saddex maalmood dabadeed uu
isugu wada yeedhay kuwii Yuhuudda ugu waaweynaa; oo
kolkii ay u yimaadeen, ayuu ku yidhi iyagii, Walaalayaalow,
anigu in kastoo aanan wax xumaan ah ku samayn dadkii
ama caadooyinkii awowayaasheen toona, haddana anoo
maxbuus ah ayaa waxaa layga soo waday Yeruusaalem oo
waxaa la ii gacangeliyey reer Rooma. 18 Iyaguna, markii
ay i imtixaameen, waxay damceen inay iska kay daayaan,
maxaa yeelay, sabab dhimasho istaahisha aanay igu jirin. 19
Laakiin Yuhuuddu markay taas qilaafeen ayaa waxaa dirqi
igu noqotay inaan Kaysar u ashtakoodo; taasuna ma ahaan
inaan haystay wax aan quruuntayda ku dacwaynayo. 20
Sababtaas daraaddeed ayaan idiin yeedhay inaan idin arko
oo aan idinla hadlo; maxaa yeelay, rajadii reer binu Israa'iil
sugayaan daraaddeed ayaan silsiladdan ugu xidhnahay.
21 Oo iyana waxay isagii ku yidhaahdeen, Annagu wax
warqadaa oo adiga kugu saabsan Yahuudiya kama aannu
helin, oo walaalihii midkoodna xaggaas kama iman, noomana
soo sheegin ama kaama soo warramin xumaato. 22 Laakiin
waxaannu jeclaan lahayn inaannu kaa maqalno waxaad u
malaynaysid; maxaa yeelay, xagga dariiqadan waxaannu
ka og nahay in meel walba ka gees ahaan lagaga hadlo.
23 Oo intay maalin ka ballanqaadeen, ayay hoygiisii ugu
yimaadeen iyagoo tiro badan, oo isna xaalkii aad buu ugu sii
caddeeyey oo u marag furay boqortooyada Ilaah, oo wuxuu
iyagii ku waaninayay wax Ciise ku saabsan oo ku yaalla
sharciga Muuse iyo nebiyadiiba tan iyo aroortii ilaa fiidkii. 24
Oo qaar baa rumaystay waxyaalihii lagu hadlay, qaar kalena
way rumaysan waayeen. 25 Oo intay dhexdooda ka heshiin
waayeen, ayay kala tageen, Bawlos se wax keliya ayuu
ku hadlay, isagoo leh, Ruuxa Quduuska ah si hagaagsan
ayuu uga dhex hadlay nebi Isayos markuu awowayaashiin
la hadlay, 26 oo ku yidhi, Adigu dadka u tag, oo waxaad
ku tidhaahdaa, Maqal baad ku maqli doontaan, mana
garan doontaan; Idinkoo arkaya, wax baad arki doontaan,
idiinmana dhaadhici doonto; 27 Waayo, dadkan qalbigoodu
waa qallafsanaaday, Oo dhib bay dhegahooda wax ugu
maqlaan, Indhahoodana way isku qabteen; Si aanay indhaha
wax ugu arkin, Oo dhegaha wax ugu maqlin, Oo qalbiga
wax ugu garan, Si aanay u soo noqon, Oo aanan u bogsiin.
28 Haddaba idinku waxaad ogaataan in badbaadadan Ilaah
loo soo diray dadka aan Yuhuudda ahayn; oo iyaguna way
maqli doonaan. 29 Oo markuu waxyaalahaas ku yidhi ayaa
Yuhuuddii iska tageen, iyagoo isla murmaya. 30 Oo laba
sannadood oo dhan ayuu iska degganaa hoy uu isagu
kiraystay, oo kulli intii u soo gashay oo dhanna wuu soo
wada dhoweeyey. 31 Oo isagoo aad u dhiirran ayuu wuxuu
ku wacdiyi jiray boqortooyada Ilaah, wuxuuna bari jiray

waxyaalaha ku saabsan Rabbi Ciise Masiix, cidnana uma diidin.

# Rooma

**1** Waxaa warqaddan qoraya Bawlos oo ah addoonkii Ciise
Masiix, oo loogu yeedhay inuu rasuul ahaado, oo gooni
looga dhigay injiilka Ilaah. 2 Injiilkaas ayuu Ilaah markii
hore nebiyadii ku ballanqaaday xagga Qorniinka quduuska
ah, 3 oo wuxuu ku saabsan yahay Wiilkiisa, kii ka dhashay
farcankii Daa'uud xagga jidhka, 4 oo sarakiciddii uu ka
sara kacay kuwii dhintay ay ku caddaysay inuu xagga
ruuxa quduusnimada yahay Wiilka Ilaah oo xoog leh oo ah
Rabbigeenna Ciise Masiix, 5 kan aannu ku helnay nimco
iyo rasuulnimo, inaannu addeecidda rumaysadka magiciisa
daraaddiis ugu geeyno quruumaha oo dhan. 6 Idinkuna
kuwaas dhexdooda aad ku jirtaan oo ah kuwii loo yeedhay oo
Ciise Masiix. 7 Waxaan warqaddan u qorayaa kuwa Rooma
jooga oo dhan oo uu Ilaah jeclaaday, oo loogu yeedhay
quduusiin. Nimco ha idinla jirto iyo nabad ka timaada Ilaaha
Aabbeheen ah iyo Rabbi Ciise Masiix. 8 Marka hore waxaan
Ilaahay xagga Ciise Masiix ugu mahadnaqayaa kulligiin,
maxaa yeelay, rumaysadkiinna waxaa lagaga warramaa
dunida oo dhan. 9 Waayo, Ilaah, kan aan ruuxayga ugu
adeego xagga injiilka Wiilkiisa, ayaa markhaati iiga ah sidaan
maalin walbaba joogsila'aan baryadayda idiinku xusuusto,
10 anigoo weyddiisanaya inaan imminka ugu dambaysta si
kastaba ku lib helo inaan Ilaah idankiisa idiinku imaado.
11 Waayo, aad baan u doonayaa inaan idin arko oo idin
siiyo hadiyad Ruuxa ka timaada inaad ku xoogaysataan;
12 taasuna waa inaan idinkula dhiirranaado rumaysadka,
kiinna iyo kaygaba. 13 Walaalayaalow, dooni maayo inaad
garan weydaan inaan marar badan damcay inaan idiin
imaado inaan idinkana midho idinku dhex lahaado sida aan
quruumaha kale ugu dhex leeyahay, laakiin waa layga hor
joogsaday ilaa haatan. 14 Waxaa waajib la iigu leeyahay
inaan wacdiyo Gariigga iyo Barbariyiinta, kuwa caqliga leh
iyo kuwa garaadka la'ba. 15 Sidaas daraaddeed anigu diyaar
baan u ahay inaan injiilka ku wacdiyo kuwiinna Rooma
joogana. 16 Waayo, anigu injiilka ka xishoon maayo, maxaa
yeelay, waa u xoogga Ilaah xagga badbaadinta ku alla kii
rumaysta, marka hore Yuhuudda dabadeedna Gariigga. 17
Waayo, dhexdiisa waxaa laga muujiyaa xaqnimada Ilaah oo
rumaysad ka timaada, rumaysadna u socota, sida qoran. Kii
xaq ahu rumaysad buu ku noolaan doonaa. 18 Cadhadii
Ilaah ayaa samada laga muujiyey iyadoo ka gees ah
cibaadodarrada iyo xaqdarrada dadka oo dhan, kuwaasoo
runta ku joojiya xaqdarro; 19 maxaa yeelay, wixii Ilaah laga
garan karo waa ka dhex muuqataa iyaga, waayo, Ilaah waa
u muujiyey iyaga. 20 Tan iyo abuurniinta dunida waxyaalihiisii
aan la arki karin ayaa bayaan loo arkaa, iyagoo laga garto
waxyaalihii la sameeyey, xataa xooggiisa daa'imiska ah
iyo ilaahnimadiisa, si ayan marmarsiinyo u lahaan. (aïdios
g126) 21 Maxaa yeelay, iyagoo Ilaah garanaya ayayan isaga
Ilaah ahaan u ammaanin, umana ay mahadnaqin, laakiin
fikirradoodii waa xumaadeen, qalbigoodii garaadka la'aana
waa madoobaaday. 22 Iyagoo kuwo caqli leh isku sheegaya
ayay nacasoobeen. 23 Ammaantii Ilaaha aan dhimanin ayay
ku beddeleen sanam u eg nin dhimanaya iyo haad iyo
xayawaan iyo waxa bogga ku gurguurta. 24 Taas aawadeed
iyagoo qalbigooda wax xun ka damacsan, Ilaah wuxuu u
daayay wasakhnimo in dhexdooda jidhkoodu ku maamuus
jabo; 25 maxaa yeelay, runtii Ilaah bay been ku beddeleen, oo
waxay caabudeen oo u adeegeen ummadda intay caabudi
lahaayeen kan uumay oo weligiis ammaanta leh. Aamiin. (aiōn
g165) 26 Saas daraaddeed Ilaah wuxuu u daayay damacyo
ceeb ah; waayo, dumarkoodu isticmaalkii loo abuuray waxay
ku beddeleen mid ka gees ah kii loo abuuray. 27 Sidaas oo
kalena raggii intay iska daayeen isticmaalkii dumarka ayay
iyagoo damacoodu gubayo isu kacsadeen; rag waxay rag
kale ku sameeyeen ceeb, oo waxay dhexdooda ka heleen
abaalgudkii qaladkooda waajibka ku ahaa. 28 Intay oggolaan
waayeen inay Ilaah ku sii haystaan aqoontooda, Ilaah wuxuu
u daayay maan dulli ah inay sameeyaan waxyaalo aan
qummanayn, 29 iyagoo ay ka buuxaan xaqdarrada, iyo
sharnimada, iyo damacnimada, iyo xumaanta oo dhammu;
waxaa kaloo ay ka buuxaan hinaasada, iyo dilidda, iyo
ilaaqda, iyo khiyaanada, iyo camalxumaanta, oo waxay yihiin
kuwa wax xun ku faqa, 30 iyo kuwa wax xanta, iyo kuwa
Ilaah neceb, iyo kuwa wax caaya, iyo kuwa kibirka badan, iyo
kuwa faanka badan, iyo kuwa wax shar ah hindisa, iyo kuwa
waalidkood caasiga ku ah, 31 iyo kuwa garaadka la', iyo kuwa
axdiga jebiya, iyo kuwa aan kalgacaylka lahayn, iyo kuwa
aan naxariista lahayn. 32 Iyagoo garanaya qaynuunka Ilaah
in kuwa waxyaalahaas sameeyaa ay dhimasho istaahilaan,
ayaanay samayn waxyaalahaas oo keliya ee weliba waxay u
bogaan kuwa sameeya.

**2** Sidaas daraaddeed, nin yahow, marmarsiinyo ma lihid ku
kastoo aad tahayba kaaga wax xukuma; maxaa yeelay,
meeshii aad ku kale ku xukuntid, waad isku xukumaysaa,
waayo, kaaga wax xukumaa, waxaad samaysaa isla wixii.
2 Oo waxaannu og nahay in xukunka Ilaah uu ka gees
yahay kuwa waxyaalaha caynkaas ah sameeya, sida runta
ah. 3 Nin yahow, ma waxay kula tahay, kolkaad xukuntid
kuwa waxyaalaha caynkaas ah sameeya oo aad isla wixiina
sameeysid, inaad xukunka Ilaah ka baxsan doonto? 4
Ma waxaad quudhsanaysaa hodantinimada wanaaggisa

iyo samirkiisa iyo dulqaadashadiisa? Miyaadan garanayn
in wanaagga Ilaah kuu kaxeeyo xagga toobadda? 5
Laakiin engegnaantaada iyo toobadla'aanta qalbigaaga
aawadood waxaad cadho u urursanaysaa maalinta cadhada
iyo muuqashada xukunka xaqa ah oo Ilaah, 6 kan nin kasta
u siin doona sida shuqulkiisu ahaa, 7 kuwa dulqaadashada
shuqulka wanaagsan ku doondoonaa ammaan iyo ciso iyo
dhimashola'aan, wuxuu siin doonaa nolosha weligeed ah;
(aiōnios g166) 8 laakiin kuwa iskala qaybqaybiya, oo aan runta
addeecin, laakiinse xaqdarrada addeeca, waxaa u ahaan
doona cadho iyo ciil, 9 iyo dhibaato iyo cidhiidhiba, oo waxay
u ahaan doonaan naf kasta oo dadka sharka sameeya,
marka hore Yuhuudda, dabadeedna Gariigga. 10 Laakiin
ammaan iyo ciso iyo nabad baa u ahaan doona ku kasta
oo wanaag sameeya, marka hore Yuhuudda, dabadeedna
Gariigga; 11 maxaa yeelay, Ilaah dadka uma kala eexdo. 12
In alla intii sharcila'aan dembaabtay, sharcila'aan bay halligmi
doonaan, oo in alla intii sharciga hoostiisa ku dembaabtayna,
sharcigaa lagu xukumi doonaa; 13 waayo, kuwa sharciga
maqlaa ma aha kuwa xaqa Ilaah hortiis, laakiinse kuwa
sharciga yeela xaq baa laga dhigi doonaa. 14 Markii dadka
aan Yuhuudda ahayn oo aan sharciga lahaynu, ay dabiicadda
ka sameeyaan waxyaalaha sharciga, kuwan aan sharciga
lahaynu waa isu sharci. 15 Waxay muujiyaan shuqulka
sharciga oo qalbiyadooda ku qoran, iyagoo garashadoodu
u markhaati furayso, oo fikirradoodu midba midka kale
ashtakaynayo ama marmarsiinyo samaysanayo, 16 maalinta
Ilaah waxyaalaha qarsoon ee dadka ku xukumi doono Ciise
Masiix sida injiilkaygu leeyahay. 17 Laakiin adigu haddaad
isku sheegtid Yuhuudi, oo sharciga isku hallaysid, oo Ilaah
ku faantid, 18 oo doonistiisa taqaanid, oo aad u bogtid
waxyaalaha aad u fiican, adigoo sharciga wax lagugu baray,
19 oo aad aaminsan tahay inaad tahay kan haga kuwa
indhaha la', iyo kan nuurka u ah kuwa gudcurka ku jira, 20
iyo kan doqonnada qumaatiya, iyo macallinka carruurta,
adigoo sharciga ku haysta muuqashadii aqoonta iyo runta; 21
haddaba kaaga kan kale wax baraa, sow wax isbari maysid?
Kaaga dadka ku wacdiya, Waxba ha xadina; adigu miyaad
wax xaddaa? 22 Kaaga yidhaahda, Yaan la sinaysan, miyaad
adigu sinaysataa? Kaaga sanamyada nebcaada, miyaad
macbudyo dhacdaa? 23 Kaaga sharciga ku faana, miyaad
Ilaah ku cisa jebisaa sharciga aad gudubtay aawadiis? 24
Waayo, magaca Ilaaha waa lagaga caytamaa quruumaha
dhexdooda idinka daraaddiin, sida qoran. 25 Waayo, hubaal
gudniintu wax bay tartaa, haddaad sharciga yeeshid, laakiin
haddaad sharciga gudubtid, gudniintaadii waxay noqotay
buuryoqabnimo. 26 Haddaba haddii mid buuryoqab ahu xajiyo
qaynuunnada sharciga, buuryoqabnimadiisii miyaan loo tirin
doonin sida gudniin? 27 Oo kan jinsigiisu buuryoqab yahay,
hadduu sharciga dhammeeyo, miyuusan ku xukumi doonin
kaaga sharciga gudba, in kastoo aad haysatid qorniinka iyo
gudniinta? 28 Waayo, kii dadka sida Yuhuudi ugu muuqdaa,
Yuhuudi ma aha; gudniinta jidhka ka muuqataana, gudniin
ma aha; 29 laakiin waxaa Yuhuudi ah kii hoosta Yuhuudi ka
ah; gudniintuna waa tan qalbiga, ee ku jirta ruuxa, oo aan
ku jirin qorniinka; kaas ammaantiisu kama timaado dadka,
waxayse ka timaadaa Ilaah.

3 Haddaba maxay Yuhuuddu dadka kale dhaantaa?
Ama gudniinta waxtarkeedu waa maxay? 2 Si walba
wuu u badan yahay; marka hore waxaa Yuhuudda lagu
ammaaneeyey hadallada Ilaah. 3 Haddaba, maxaa jira,
haddii qaar aanay rumaysad lahayn? Rumaysaddarradoodu
miyey Ilaah aaminnimadiisa burin doontaa? 4 Ma suurtowdo!
Ilaah runlow ha ahaado in kastoo nin waluba beenlow
yahay, sida qoran, In xaq lagaaga dhigo hadalladaada,
Oo aad libaantid markii lagu xukumo. 5 Laakiin haddii
xaqnimola'aanteennu muujiso xaqnimada Ilaah, maxaynu
odhan doonnaa? Ma xaq daranyahay Ilaaha cadhada soo
dejiyaa? (Sida dad baan u hadlayaa.) 6 Ma suurtowdo!
Hadduu xaq daranyahay, sidee baa Ilaah dunida u xukumi
doonaa? 7 Runta Ilaah hadday beentayda ugu badatay
ammaantiisa, de maxaa aniga haddana weli la iigu xukumaa
sida mid dembi leh? 8 Maxaannu u odhan weynaa, Shar
aan samayno in wanaag yimaado? sida lanoo hafro oo ay
qaar naga sheegaan sidii annagoo nidhaahna. Xukunka
ay kuwaasu helaan waa xaq. 9 Waa maxay haddaba?
Miyaynu dhaannaa iyaga? Maya, sinaba. Waayo, horaannu
u dacweynay Yuhuudda iyo Gariigtaba inay kulligood dembi
ku hoos jiraan. 10 Sida qoran, Mid xaq ahu ma jiro, midnaba;
11 Mid wax garanayaa ma jiro; Mid Ilaah doondoonaa ma
jiro; 12 Dhammaantood gees bay u wada leexdeen, waxay
wada noqdeen wax aan wax tar lahayn; Mid wanaag falaa
ma jiro, midnaba; 13 Hungurigoodu waa xabaal furan;
Carrabbadooda wax bay ku khiyaaneeyeen; Bushimahooda
waxaa ku hoos jira sun jilbis; 14 Afkooda waxaa ka buuxa
habaar iyo qadhaadh; 15 Cagahoodu waxay u dheereeyaan
inay dhiig daadiyaan; 16 Jidadkooda waxaa yaal hoog iyo
ba'; 17 Jidka nabaddana ma yaqaaniin; 18 Cabsida Ilaahna
indhahooda ma hor taal. 19 Waannu og nahay in wax alla
wixii sharcigu yidhaahdo, uu ku leeyahay kuwa sharciga ku
hoos jira, in af kasta la xidho, oo dunida oo dhammu ay Ilaah
ku hor gar darnaato. 20 Maxaa yeelay, shuqullada sharciga
ninna xaq ku noqon maayo Ilaah hortiis, waayo, sharciga

ayaa lagu gartaa dembiga. 21 Laakiin haatan sharciga
la'aantiis ayaa xaqnimadii Ilaah la muujiyey, waxaana u
marag furay sharciga iyo nebiyadii, 22 waxaana weeyaan
xaqnimada Ilaah ee lagu helo rumaysadka xagga Ciise
Masiix oo u ah in alla inta rumaysata oo dhan, waayo,
kala duwanaan ma leh. 23 Maxaa yeelay, dhammaan way
wada dembaabeen oo gaadhi waayeen ammaanta Ilaah;
24 iyagoo hadiyad ahaan xaq lagaga dhigay nimcadiisa
xagga madaxfurashada Ciise Masiix ku furtay, 25 kan
Ilaah u soo bixiyey inuu dhiiggiisa kafaaraggud ku noqdo
xagga rumaysadka la rumaystay dhiiggiisa aawadiis, inuu
xaqnimadiisa ku muujiyo dembidhaafka uu dembiyadii hore
loo sameeyey ku dhaafay samirkii Ilaah; 26 waxaa weeye
muujinta xaqnimadiisa ee haatan joogta inuu isaga qudhiisu
xaq ahaado iyo kan xaq ka dhiga kan Ciise rumaysan.
27 Haddaba faankii meeh? Waa reebban yahay. Sharci
caynkee ah buu ku hadhay? Ma xagga shuqulladaa? Maya;
laakiinse wuxuu ku hadhay sharciga rumaysadka. 28 Sidaas
daraaddeed waxaannu ku tirinnaa in nin xaq ku noqdo
rumaysadka ee uusan xaq ku noqon shuqullada sharciga.
29 Ama Ilaah ma Ilaaha Yuhuudda oo keliya baa? Miyuusan
ahayn kan quruumaha kalena? Haah, waa yahay kan
quruumaha kalena, 30 hadday tahay in Ilaah mid keliya
yahay oo uu kuwa gudan xaq kaga dhigi doono rumaysadka,
kuwa buuryoqabka ahna rumaysadka. 31 De miyaannu
haddaba sharciga ku burinnaa rumaysadka? Yaanay noqon!
Laakiin sharciga waannu taagnaa.

**4** Haddaba maxaynu nidhaahnaa inuu helay Ibraahim oo
awowgeennii hore ahaa xagga jidhka? 2 Waayo, haddii
Ibraahim shuqullo xaq ku noqday, wax uu ku faano buu
leeyahay ee Ilaah hortiisa ma aha. 3 Maxaa Qorniinku
leeyahay? Ibraahimna Ilaah buu rumaystay, oo waxaa isaga
loogu tiriyey xaqnimo. 4 Haddee kii shaqeeya abaalgudkiisa
looguma tiriyo sida nimco laakiinse sida qaan oo kale. 5
Laakiin kii aan shaqayn illowse rumaysta kan xaq ka dhiga
kuwa aan cibaadada lahayn, rumaysadkiisa waxaa lagu
tiriyaa xaqnimo. 6 Sida Daa'uudna uga sheegayo barakadii
ninkii Ilaah xaq u tiriyo shuqullola'aantood, isagoo leh, 7
Waxaa barakaysan kuwa xadgudubyadooda la cafiyey, Oo
dembiyadooda la daboolay. 8 Waxaa barakaysan ninkii
Rabbigu uusan dembi u tirinayn. 9 Haddaba barakadan
miyaa lagaga hadlay kuwa gudan oo keliya, mise kuwa
buuryoqabka ahna waa lagaga hadlay? Waayo, waxaannu
nidhaahnaa, Ibraahim rumaysadkiisii waxaa loogu tiriyey
xaqnimo. 10 Sidee baa haddaba loogu tiriyey? Ma markuu
gudnaa, mise markuu buuryoqabka ahaa? Ma aha markuu
gudnaa, laakiinse waa markuu buuryoqabka ahaa; 11 oo
wuxuu helay calaamada gudniinta, tan ahayd shaabaddii
xaqnimada oo rumaysadkii uu haystay intuu buuryoqabka
ahaa; inuu noqdo aabbihii inta rumaysata oo dhan in kastoo
ay buuryoqab yihiin, in xaqnimo loo tiriyo iyaga, 12 iyo inuu
aabbaha gudniinta u noqdo kuwa aan ahayn kuwa gudan oo
keliya laakiinse kuwa ku socda tallaabooyinka rumaysadka
ee Aabbeheen Ibraahim haystay intuu buuryoqabka ahaa.
13 Waayo, ballankii lagula ballamay Ibraahim ama farcankiisii
inuu ku noqdo kii dunida dhaxli lahaa, uguma iman sharciga,
laakiinse wuxuu ugu yimid xaqnimada rumaysadka. 14
Waayo, haddii kuwa sharciga leh ay noqdaan kuwa dhaxalka
leh, de markaas rumaysadkii waxaa laga dhigay wax aan
waxtar lahayn, ballankiina waa la buriyey, 15 maxaa yeelay,
sharcigu wuxuu keenaa cadho, laakiinse meeshii aan
sharci jirin xadgudubna ma jiro. 16 Taas daraaddeed waa
xagga rumaysadka inay noqoto xagga nimcada, in ballanku
hubaal u ahaado farcanka oo dhan; ee uusan u ahayn kan
sharciga leh oo keliya, laakiinse inuu u ahaado kan leh
rumaysadkii Ibraahim, kan aabbaha inoo ah kulligeen, 17
(sida qoran, Quruumo badan baan aabbe kaaga dhigay)
Ilaaha uu rumaystay hortiisa, kan nooleeya kuwii dhintay
oo u yeedha waxyaalaha aan jirin sida iyagoo jira. 18
Ibraahim rajuu wax ku rumaystay iyadoo aan rajo jirin inuu
aabbe u noqdo quruumo badan, sida waxyaalihii lagula
hadlay leeyihiin, Farcankaagu sidaasuu noqon doonaa. 19
Isagoo aan rumaysadkii ku tabaryaraan wuxuu ka fikiray
jidhkiisii sida meyd oo kale ahaa (isagoo boqol jir ku
dhow) iyo meydnimadii maxalkii Saarah. 20 Ballankii Ilaah
rumaysaddarro kagama uu shakiyin, laakiinse rumaysad
buu ku xoogaystay, isagoo Ilaah ammaanaya 21 oo aad
u huba in wixii uu u ballanqaaday uu samayn karo. 22
Sidaas daraaddeedna waxaa loogu tiriyey xaqnimo. 23 Wixii
loo tiriyey looma qorin isaga aawadiis oo keliya, 24 laakiin
waxaa loo qoray innaga aawadeenna. Waa loo tirin doonaa
kuweenna rumaysan kii kuwii dhintay ka soo sara kiciyey
Rabbigeenna Ciise, 25 kii loo bixiyey xadgudubkeenna
aawadiis oo loo sara kiciyey inuu xaq inaga dhigo.

**5** Sidaas daraaddeed innagoo xaq laynagaga dhigay
rumaysad, nabad baynu xagga Ilaah ku haysannaa
Rabbigeenna Ciise Masiix; 2 kan xaggiisa aynu rumaysad ku
galnay nimcadan aynu dhex taagan nahay, oo waxaynu ku
faraxnaa rajada ammaanta Ilaah. 3 Oo taas oo keliya ma aha,
laakiinse waxaynu ku faraxnaa dhibaatooyinkeenna, innagoo
og in dhibaatadu dulqaadasho keento; 4 dulqaadashaduna
aqoon dheer, aqoonta dheeruna rajo; 5 rajaduna inama

ceebayso, maxaa yeelay, jacaylka Ilaah baa qalbiyadeenna
ku dhex shubmay, oo waxaa ku shubay Ruuxa Quduuska
ah oo layna siiyey. 6 Waayo, innagoo weli itaaldaran ayuu
Masiixu wakhti qumman u dhintay kuwa aan cibaadada
lahayn. 7 Mar dhif ah mid waa u dhintaa nin xaq ah,
mindhaase qof waa ku dhici lahaa inuu nin wanaagsan u
dhinto. 8 Laakiinse Masiixu waa inoo dhintay intaynu weli
dembilayaal ahayn, oo sidaasuu Ilaah jacaylkiisii inoogu
muujiyey. 9 Haddaba haddaynu haatan dhiiggiisa xaq ku
noqonnay, de si ka badanna isagaynu kaga badbaadi
doonnaa cadhada Ilaah. 10 Waayo, haddii, intaynu col la
ahayn, Ilaah inagula heshiiyey dhimashadii Wiilkiisa, de si
ka badanna, innagoo la heshiis ah, ayaynu ku badbaadi
doonnaa noloshiisa, 11 oo taas oo keliyana ma ahaane,
weliba waxaynu ku faraxnaa Ilaah xagga Rabbigeenna
Ciise Masiix, kan aynu haatan heshiiska ku helnay. 12
Haddaba sida dembigu nin keliya dunida ugu soo galay,
dhimashaduna dembiga ugu timid, sidaasaa dhimashadiina
u gaadhay dadka oo dhan, waayo, waa la wada dembaabay;
13 waayo, dembigu duniduu ku jiray intaan sharcigu iman,
laakiin dembi lama tiriyo markii aan sharci jirin. 14 Habase
ahaatee waagii Aadan ilaa Muuse dhimashadu waxay u
talisay xataa kuwii aan u dembaabin sidii xadgudubkii Aadan
kan ah masaalka kan iman lahaa. 15 Hadiyaddu ma aha
sida dembiga, waayo, haddii nin keliya dembigiis kuwa
badanu u dhinteen, de in ka sii badan waxaa kuwa badan u
badatay nimcada Ilaah iyo hadiyadda nin nimcadiis ku timid,
kan ah Ciise Masiix. 16 Hadiyaddu ma aha sida mid qof
dembaabay ku timid, waayo, mid xukunkiis wuxuu keenay
ciqaab, laakiin hadiyaddu waxay dembiyo badan ugu timid
inay xaq ka dhigto kuwo badan. 17 Haddii mid dembigiisa
aawadiis ay dhimasho ku talisay midkaas aawadiis, de si
ka badanna kuwa hela badnaanta nimcada iyo hadiyadda
xaqnimada, noloshay ku dhex talin doonaan kii kale aawadiis
kaas oo ah Ciise Masiix. 18 Haddaba dembiga nin keliya
aawadiis waxaa dadka oo dhan ugu yimid xukun, sidaas oo
kalena nin keliya xaqnimaduu sameeyey aawadeed waxaa
dadka oo dhan ugu timid hadiyad in xaq laga dhigo oo
ay noolaadaan. 19 Waayo, sida nin keliya caasinimadiisii
kuwa badan dembilayaal looga dhigay, sidaas oo kalena
nin keliya addeeciddiis ayaa kuwa badan xaq looga dhigi
doonaa. 20 Sharciguna wuxuu u yimid inuu dembigu bato,
laakiinse meeshii dembigu ku batay, nimcaduna way ka sii
badatay aad iyo aad; 21 in, sida dembigu dhimashada ugu
taliyey, sidaas oo kalena ay nimcadu ugu taliso xaqnimo ilaa
nolosha weligeed ah ee xagga Rabbigeenna Ciise Masiix.
**(aiōnios g166)**

**6** Haddaba maxaynu nidhaahnaa? Miyaynu ku sii soconnaa
dembiga inay nimcadu badato? 2 Yaanay noqon! Innagoo
dembiga kala dhimannay, sidee baynu mar dambe ugu
dhex noolaannaa? 3 Mise ma waydaan ogayn in kulli
inteenna lagu baabtiisay Ciise Masiix dhexdiisa, lagu dhex
baabtiisay dhimashadiisa? 4 Haddaba waxaynu isaga kula
aasannay baabtiiska dhimashada dhexdeeda, in, sidii Masiixa
kuwii dhintay loogaga sara kiciyey ammaanta Aabbaha,
aan innaguna sidaas oo kale cusaybka nolosha ku dhex
soconno. 5 Haddaynu isaga kula midownay dhimasho tiisa
u eg, de sidaas oo kalena sarakicid tiisa u eg waynu kula
midoobi doonnaa. 6 Waynu og nahay in dabiicaddeennii
hore iskutallaabta lagula qodbay isaga, in jidhka dembigu
baabba'o, si aynaan mar dambe addoommo ugu ahaan
dembiga. 7 Waayo, kii dhintay dembi wuu ka xoroobay oo xaq
baa laga dhigay. 8 Laakiinse haddaynu Masiixa la dhimannay,
waxaynu rumaysan nahay inaynu haddana isaga la noolaan
doonno. 9 Waynu og nahay in Masiixa oo kuwii dhintay ka
sara kacay uusan mar dambe dhimanayn; dhimashadu mar
dambe u talin mayso. 10 Waayo, dhimashaduu dhintay mar
keliya ayuu xagga dembiga ka dhintay, laakiin noloshuu ku
nool yahay, Ilaah buu u nool yahay. 11 Sidaas oo kalena
idinku isku tiriya inaad dembiga u tihiin kuwo dhintay, oo
aad Ilaah u tihiin kuwo nool xagga Ciise Masiix. 12 Sidaas
daraaddeed dembigu yuusan jidhkiinna dhimanaya u talin
inaad damacyadiisa xunxun addeecdaan. 13 Xubnihiinnana
dembiga ha u siinina sida qalabka xaqdarrada, laakiin Ilaah
isa siiya sida idinkoo ah kuwo ka soo noolaaday kuwii
dhintay, xubnihiinnana Ilaah u siiya sida qalabka xaqnimada.
14 Waayo, dembigu idiinma talin doono, maxaa yeelay,
sharciga kuma hoos jirtaan, laakiinse waxaad ku hoos jirtaan
nimcada. 15 Waa sidee haddaba? Sharciga kuma hoos jirno,
oo waxaynu ku hoos jirnaa nimcada, sidaas daraaddeed
miyaan dembaabnaa? Yaanay noqon! 16 Ma waydaan ogayn
inaad addoommo u tihiin kii aad isu siisaan sida addoommo
addeeca, oo aad addoommadiisa tihiin kii aad addeecdaan,
ama ha noqoto dembiga idiin kaxeeya xagga dhimashada
ama addeecidda idiin kaxaysa xagga xaqnimada? 17
Laakiinse mahad Ilaah baa leh, waayo, waxaad ahaan
jirteen addoommadii dembiga, haatanse qalbigiinaad ka
addeecdeen caynaddii waxbariddii laydin siiyey; 18 oo idinkoo
dembiga laydinka xoreeyey, xaqnimada ayaad addoommo
u noqoteen. 19 Sida dadkaan u hadlayaa jidhkiinna
itaaldarradiisa aawadeed. Waayo, sidii aad xubnihiinna uga
dhigi jirteen addoommadii wasakhnimada iyo dembiga inaad
dembi fashaan, sidaas oo kalena haatan xubnihiinna ka
dhiga addoommadii xaqnimada quduusnaanta aawadeed.

20 Waayo, markaad addoommadii dembiga ahaan jirteen,
xagga xaqnimada waxaad ahaydeen xor. 21 Haddaba
wakhtigaas maxaad midho ku haysateen waxyaalaha
aad haatan ka xishoonaysaan? Waayo, waxyaalahaas
ugu dambaystoodu waa dhimashada. 22 Laakiin haatan
idinkoo dembi laydinka xoreeyey oo aad addoommadii Ilaah
noqoteen, waxaad midho ku haysataan quduusnaanta, oo
ugu dambaysteeduna waa nolosha weligeed ah. (aiōnios
g166) 23 Waayo, mushahaarada dembigu waa dhimashada,
laakiinse hadiyadda Ilaah waa nolosha weligeed ah ee laga
helo Rabbigeenna Ciise Masiix. (aiōnios g166)

7 Mise ma waydaan ogayn, walaalayaalow, in sharcigu nin
u taliyo intuu nool yahay oo keliya? (Waxaan la hadlayaa
dadka sharciga yaqaan.) 2 Naagtii nin luhu sharcigay ugu
xidhan tahay ninkeeda intuu nool yahay, laakiinse mar haddii
ninku dhinto, way ka furan tahay sharcigii ninka. 3 Sidaas
daraaddeed inta ninkeedu nool yahay, hadday nin kale
naag u noqoto, waxaa loogu yeedhi doonaa dhillo, laakiinse
ninkeedu hadduu dhinto, sharciga way ka furan tahay, oo
sidaas daraaddeed dhillo ma aha in kastoo ay nin kale
naag u noqoto. 4 Sidaas daraaddeed, walaalahayow, jidhkii
Masiixa baa meyd idinka dhigay xagga sharciga, in mid kale
idin lahaado, oo ah kii kuwii dhintay laga sara kiciyey inaynu
Ilaah midho u soo bixinno. 5 Waayo, markii aynu jidhka ku
dhex jirnay, damacyadii dembiyada ee sharciga ka yimid
waxay ka dhex shaqaynayeen xubnaheenna inay midho u
soo bixiyaan dhimasho. 6 Laakiinse haatan sharcigii waa
laynaga furay, innagoo ka dhimannay wixii aynu ku hoos
xidhnayn, si aynu ugu adeegno cusaybka ruuxa ee aynaan
ugu adeegin gabowga qorniinka. 7 Haddaba maxaynu
nidhaahnaa? Sharcigu ma dembi baa? Ma suurtowdo! Hase
ahaatee, dembi ma aanan garteen, sharcigaan ku gartay
mooyaane, damaca xun ma aanan garteen haddaan sharcigu
i odhan, Waa inaadan wax damcin. 8 Dembigu, isagoo
wakhti helay, ayuu amarka dhexdayda kaga falay damac
xun oo kasta; waayo, sharciga la'aantiis dembigu waa meyd.
9 Waa baan noolaa sharciga la'aantiis, laakiin markii amarku
yimid, dembigu waa soo noolaaday, aniguna waan dhintay.
10 Amarkii nolosha ii geeyn lahaa, waxaan gartay inuu
dhimasho ii geeynayo. 11 Waayo, dembigu, isagoo wakhti
helay, ayuu amarka igu khiyaaneeyey, wuuna igu dilay. 12
Haddabase sharcigu waa quduus, amarkuna waa quduus,
waana xaq, wuuna wanaagsan yahay. 13 Haddaba wixii
wanaagsanaa miyey dhimasho ii noqdeen? Ma suurtowdo!
Laakiin dembigu, inuu muuqdo inuu dembi yahay, ayuu wax
wanaagsan igaga dhex shaqeeyey oo dhimasho ii keenay,
in dembigu amarka ku noqdo dembi miidhan. 14 Waayo,
waxaynu og nahay in sharcigu ku saabsan yahay ruuxa,
laakiinse anigu waxaan ahay mid jidhka raaca oo lagu iibiyey
dembiga hoostiisa. 15 Waayo, waxaan samaynayo garan
maayo, maxaa yeelay, ma sameeyo wixii aan doonayo,
laakiin waxaan sameeyaa wixii aan necbahay. 16 Laakiin
haddaan sameeyo waxa aanan doonayn, de markaas
waxaan gartay in sharcigu wanaagsan yahay. 17 Haddabase
haatan ma aha aniga kan waxaas sameeyaa, laakiinse
waa dembiga igu dhex jira. 18 Waayo, waan ogahay inaan
wax wanaagsanu igu dhex jirin, taas waxaan ula jeedaa,
jidhkayga wax wanaagsanu kuma jiraan, waayo, waan ku
talo jiraa inaan waxa wanaagsan sameeyo, laakiin ma
sameeyo. 19 Waayo, waxa wanaagsan oo aan doonayo
inaan falo, ma sameeyo, laakiinse waxa sharka ah oo aanan
doonayn inaan falo, ayaan sameeyaa. 20 Laakiin haddaan
sameeyo wixii aanan doonayn inaan falo, de haatan ma
aha aniga kan sameeyaa, laakiinse waa dembiga igu dhex
jira. 21 Haddee waxaan arkaa qaynuunka in shar ila jiro
in kastoo aan doonayo inaan waxa wanaagsan sameeyo.
22 Waayo, sharciga Ilaah ayaan kaga farxaa ninka gudaha
ah. 23 Laakiin waxaan xubnahayga ka arkaa qaynuun kale,
isagoo la dagaallamaya qaynuunka maankayga oo maxbuus
iiga dhigaya qaynuunka dembiga oo xubnahayga ku jira.
24 Nin belaysan baan ahay. Yaa iga furan doona jidhkan
dhimashada leh? 25 Waxaan Ilaah ugu mahadnaqayaa inuu
Rabbigeen Ciise Masiix igu furan doono. Sidaas daraaddeed
aniga qudhaydu waxaan maankayga ugu adeegaa sharciga
Ilaah; laakiinse waxaan jidhka ugu adeegaa qaynuunka
dembiga.

8 Sidaas daraaddeed, kuwa Ciise Masiix ku dhex jiraa,
haatan xukun ma laha. 2 Waayo, qaynuunka Ruuxa
nolosha ee ku dhex jira Ciise Masiix ayaa iga xoreeyey
qaynuunka dembiga iyo dhimashada. 3 Waayo, wax aan
sharcigu samayn karayn, maxaa yeelay, wuu itaaldarnaa
jidhka aawadiis, ayaa Ilaah sameeyey isagoo Wiilkiisa ku soo
diraya u-ekaantii jidhka dembiga leh oo u soo diraya dembiga
aawadiis, wuxuuna xukumay dembigii jidhka ku jiray, 4 in
qaynuunka sharcigu inagu buuxsamo kuweenna aan sida
jidhka u socon, laakiinse u socda sida Ruuxa. 5 Waayo, kuwa
sida jidhka u socdaa, waxay ka fikiraan waxyaalaha jidhka,
laakiinse kuwa sida Ruuxa u socdaa, waxay ka fikiraan
waxyaalaha Ruuxa. 6 Jidhka kafikiriddiisu waa dhimashada,
laakiinse Ruuxa kafikiriddiisu waa nolosha iyo nabadda, 7
maxaa yeelay, jidhka kafikiriddiisu waa la col Ilaah, waayo,
ma hoos gasho sharciga Ilaah, mana hoos geli karto. 8

Kuwa jidhka ku dhex jiraana kama farxin karaan Ilaah. 9
Laakiin idinku kuma aad dhex jirtaan jidhka, illowse waxaad
ku dhex jirtaan Ruuxa, haddii Ruuxa Ilaah idinku dhex jiro.
Laakiin nin hadduusan Ruuxa Masiixa lahayn, de kaasu
kiisii ma aha. 10 Oo haddii Masiixu idinku dhex jiro, jidhku
waa meyd dembiga aawadiis; laakiinse ruuxu waa nolosha
xaqnimada aawadeed. 11 Laakiin haddii Ruuxii kii Ciise kuwii
dhintay ka soo sara kiciyey idinku dhex jiro, kii Ciise Masiix
kuwii dhintay ka soo sara kiciyey, jidhkiinna dhimanayana
wuxuu ku noolayn doonaa Ruuxiisa idinku dhex jira. 12
Sidaas daraaddeed, walaalayaalow, wax baa inagu waajib
ah, laakiin waajib inooguma aha jidhka, inaynu u noolaanno
sida jidhka, 13 waayo, haddaad sida jidhka u noolaataan,
hubaal waad dhiman doontaan, laakiin haddaad falimaha
jidhka Ruuxa ku dishaan, waad noolaan doontaan. 14 In alla
intii Ruuxa Ilaah hoggaamiyo, waa carruurta Ilaah. 15 Waayo,
ma aydnaan helin ruuxa addoonnimada inaad mar kale
cabsataan, laakiinse waxaad hesheen Ruuxa carruur idinka
dhigay, kan aynu ku qaylinno Aabbow. 16 Ruuxa qudhiisu
wuu markhaati furaa oo wuxuu ruuxeenna u sheegaa inaynu
innagu nahay carruurta Ilaah. 17 Oo haddaynu carruur
nahay, de haddaba waxaynu nahay kuwo wax dhaxla,
kuwo Ilaah dhaxla oo Masiix wax la dhaxla, haddii aynu
isaga la xanuunsanno, in laynala ammaano isaga. 18
Waxaan ku tirinayaa in waxyaalaha wakhtigan la joogo lagu
xanuunsadaa ayan istaahilin in lala simo ammaanta iman
doonta oo laynoo muujin doono. 19 Uunku wuxuu filasho aad
u weyn ku sugaa muujinta carruurta Ilaah. 20 Uunkii waxaa
la hoos geliyey wax aan waxtar lahayn, ikhtiyaarkiisna uma
uu hoos gelin, laakiin waa kii hoos geliyey aawadiis, 21
taasoo la rajaynayo in uunka qudhiisana laga xorayn doono
addoonnimada qudhunka ah oo la gelin doono xorriyadda
ammaanta carruurta Ilaah. 22 Waayo, waxaynu og nahay
in uunka oo dhammu wada taahayo oo wada foolanayo
ilaa haatan. 23 Iyagoo keliya ma aha, laakiin innagana waa
sidaas oo kale, kuweenna haysta midhihii ugu horreeyey ee
Ruuxa, xataa innaga qudheennu dhexdeenna ayaynu ka
taahnaa, innagoo sugayna carruurnoqoshadeenna, taasu
waxaa weeyaan samatabbixinta jidhkeenna. 24 Waayo,
waxaynu ku badbaadnay rajo, laakiin rajadii la arko rajo ma
aha, maxaa yeelay, waa ayo kan rajeeyaa wuxuu arko? 25
Laakiin haddaynu rajayno wax aynaan arkin, de haddaba
dulqaadasho ayaynu ku sugnaa. 26 Sidaasoo kalena Ruuxu
wuxuu inaga caawimaa itaaldarradeenna, waayo, garan
mayno wax inoo eg oo aynu ku tukanno, laakiin Ruuxa
qudhiisu waa inoo duceeyaa isagoo ku taahaya taah aan
sanqadhayn. 27 Oo kii qalbiyada baadhaa waa yaqaan fikirka
Ruuxa, maxaa yeelay, wuxuu quduusiinta ugu duceeyaa
sida Ilaah doonayo. 28 Oo waxaynu og nahay in wax waliba
wanaag ugu wada shaqeeyaan kuwa Ilaah jecel, xataa
kuwa qasdigiisa loogu yeedhay. 29 Waayo, kuwuu hore u
yiqiin wuxuu haddana hore ugu doortay inay u ekaadaan
suuradda Wiilkiisa, inuu isagu curad ku noqdo walaalo
badan dhexdood. 30 Oo kuwuu hore u doortayna, haddana
wuu u yeedhay, kuwuu u yeedhayna, haddana xaq buu ka
dhigay, kuwuu xaq ka dhigayna, haddana wuu ammaanay.
31 Haddaba maxaan waxyaalahan ka nidhaahnaa? Haddii
Ilaah inala gees yahay, yaa inaga gees ah? 32 Kii aan xataa
Wiilkiisa lexejeclaysan, laakiinse innaga dhammaanteen
u bixiyey, sidee buusan wax walbana inoola siin doonin
isaga? 33 Yaa ashtakayn doona kuwa Ilaah doortay? Waa
Ilaah kan wax xaq ka dhigaa. 34 Waa ayo kan wax xukumi
doonaa? Waa Ciise Masiix kii dhintay, oo haddana kuwii
dhintay ka sara kacay, oo Ilaah midigtiisa jooga, oo haddana
inoo duceeya innaga. 35 Yaa jacaylka Masiixa inaga sooci
doona? Ma dhibaato, mise cidhiidhi, mise silic, mise baahi,
mise arrad, mise khatar, mise seef? 36 Sida qoran, Adiga
daraaddaa ayaa lanoo laayaa maalinta oo dhan, Waxaa
lanoo tiriyey sida ido la qalayo. 37 Maya, waxyaalahan oo
dhan dhexdooda aad baynu ugu guulaysannaa kii ina jeclaa
xaggiisa. 38 Waayo, waxaan hubaa inaan dhimashada,
ama nolosha, ama malaa'igaha, ama kuwa madaxda ah,
ama waxyaalaha haatan jooga, ama waxyaalaha iman
doona, ama kuwa xoogga leh, 39 ama kor, ama hoos,
ama uun kaleeto inaga sooci karin jacaylka Ilaah oo ku jira
Rabbigeenna Ciise Masiix.

**9** Runtaan ku sheegayaa Masiixa, oo been sheegi maayo,
qalbigayguna marag buu iigu furayaa Ruuxa Quduuskaa
2 in caloolxumo weyn iyo xanuun aan joogsanaynin ay
ku jiraan qalbigayga. 3 Waayo, waxaan jeclaan lahaa
inaan aniga qudhaydu ka inkaarnaado Masiixa walaalahay
aawadood oo ah xigaalkayga aannu isku jidhka nahay,
4 kuwa ah reer binu Israa'iil, oo leh carruur-ka-dhigidda,
iyo ammaanta, iyo axdiyada, iyo sharciga siintiisa, iyo u-
adeegidda Ilaah, iyo ballamada, 5 kuwa awowayaasha leh,
oo xagga jidhka Masiixu ka yimid iyaga, kan wax walba ka
sarreeya oo ah Ilaah ammaanta leh weligiis. Aamiin. **(aiōn
g165)** 6 Laakiin mana aha sidii iyadoo ereygii Ilaah dhacay.
Waayo, kuwa Israa'iil ka dhashay kulligood reer binu Israa'iil
ma wada aha. 7 Farcankii Ibraahim oo ay yihiin aawadeed
kulligood carruur kuma wada aha, laakiin waxaa la yidhi,
Kuwa Isxaaq ka farcama ayaa farcankaaga loogu yeedhi
doonaa. 8 Taas waxaa weeyaan, inaan carruurta jidhku

ahayn carruurta Ilaah, laakiin carruurtii loo ballanqaaday
ayaa farcan lagu tiriyaa. 9 Waayo, kanu waa hadal ballan
ah, Wakhtigan oo kale ayaan kuu iman doonaa, oo Saarah
waxay dhali doontaa wiil. 10 Oo taas oo keliyana ma
ahee, laakiin Rebeqahna mid bay u uuraysatay, kaas oo
ahaa aabbeheen Isxaaq. 11 Waayo, carruurta oo aan weli
dhalan oo aan weli samayn wanaag iyo xumaan midna, in
qasdiga Ilaah doorashada ku istaago, oo uusan ahaan xagga
shuqullada, laakiin xagga kii dadka u yeedha, 12 waxaa iyada
lagu yidhi, Kan weynu wuxuu u adeegi doonaa kan ka yar.
13 Sida qoran, Yacquub waan jeclaaday, Ceesawse waan
necbaaday. 14 Maxaan nidhaahnaa haddaba? Ma xaqdarro
baa Ilaah la jirta? Ma suurtowdo! 15 Waayo, wuxuu Muuse ku
yidhi, Waan u naxariisan doonaa kii aan u naxariisto, waanan
u nixi doonaa, kii aan u naxo. 16 Sidaas daraaddeed xagga
kan doonaya ma aha, xagga kan ordana ma aha, laakiinse
waa xagga Ilaaha naxariista leh. 17 Waayo, Qorniinku wuxuu
Fircoon ku leeyahay, Tan daraaddeed baan kuu sara kiciyey
inaan xooggayga adiga kaa dhex muujiyo iyo in magacayga
dhulka oo dhan lagu faafiyo. 18 Haddaba kuu doonayo wuu u
naxariistaa, kuu doonayona qalbigiisuu engejiyaa. 19 Waxaad
igu odhan doontaa, Muxuu weli ii eedaynayaa? Waayo, yaa
doonistiisa ka gees noqda? 20 Laakiinse, nin yahow, kumaad
tahay kaaga Ilaah u jawaabayow? Wixii la sameeyey miyey
kii sameeyey ku odhan doonaan, Maaxad sidan noogu
samaysay? 21 Dheriyasameeyuhu miyuusan lahayn amar uu
ugu taliyo dhoobada inuu fud keliya in ka sameeyo weel cisa
leh, inta kalena mid aan cisa lahayn? 22 Bal maxay la tahay
Ilaah haddii, isagoo doonaya inuu cadhadiisa muujiyo oo
xooggiisa dadka ogeysiiyo, uu samir badan ugu dulqaatay
weelasha cadhada oo loo diyaariyey baabbi'idda, 23 iyo inuu
hodantinimadii ammaantiisa ogeysiiyo weelasha naxariista
oo uu hore ugu diyaariyey ammaanta, 24 xataa kuweenna
uu u yeedhay oo uusan uga yeedhin Yuhuudda oo keliya
laakiinse uu uga yeedhay quruumaha kalena? 25 Siduu
Hooseeca ka dhex yidhi, Kuwo aan dadkaygii ahayn ayaan
u bixin doonaa, Dadkayga, Tu aan ahayn gacalisadaydiina
waxaan u bixin doonaa, Gacaliso. 26 Oo waxay noqon
doontaa, meeshii laga yidhi iyaga, Dadkayga ma ihidin,
Meeshaas waxaa looga bixin doonaa, Carruurtii Ilaaha nool.
27 Oo Isayos wuxuu ku qayliyey wax Israa'iil ku saabsan
isagoo leh, In kastoo tirada reer binu Israa'iil noqoto sida
cammuudda badda, intii hadhay waa badbaadi doontaa,
28 waayo, Rabbigu hadalkiisa dhulkuu ku samayn doonaa,
isagoo dhammaystiraya oo soo gaabinaya, 29 oo sidii Isayos
hore u yidhi, Haddaan Rabbigii Saba'ood farcan inoo reebin,
Sidii Sodom baan noqon lahayn, oo sidii Gomora baa laynaga
dhigi lahaa. 30 Maxaan nidhaahnaa haddaba? Dadka aan
Yuhuudda ahayn oo aan xaqnimada raacin, waxay heleen
xaqnimada, oo ah xaqnimada rumaysad lagu helo; 31
laakiin reer binu Israa'iil iyagoo raaca sharciga xaqnimada,
sharcigaas ma ay gaadhin. 32 Tan sababteedu waa maxay?
Maxaa yeelay, rumaysad kuma ay doondoonin, shuqullada
samayntooda mooyaane. Waxay ku turunturoodeen dhagaxii
turunturada; 33 sida qoran, Bal eega, waxaan Siyoon
dhex dhigayaa dhagax lagu turunturoodo oo ah sallax lagu
xumaado; Oo kii rumaysta isaga ma ceeboobi doono.

**10** Walaalayaalow, waxaan qalbigayga ka doonayaa oo
Ilaah ka baryaa inay iyagu badbaadaan. 2 Waayo,
waxaan markhaati u furayaa inay iyagu Ilaah qiiro weyn
u qabaan, laakiinse xagga aqoonta ma aha. 3 Waayo,
iyagoo aan ogayn xaqnimada Ilaah oo doonaya inay taagaan
tooda, ayayan hoos gelin Ilaah xaqnimadiisa. 4 Waayo,
Masiixu wuxuu mid kasta oo rumaysta u yahay sharciga
dhammaadkiisii xagga xaqnimada. 5 Waayo, Muuse wuxuu
qoray in ninkii yeelaa xaqnimada sharciga uu ku noolaan
doono iyada. 6 Laakiin xaqnimada rumaysadku sidanay
tidhaahdaa, Qalbigaaga ha iska odhan, Yaa samada kori
doona (inuu Masiix soo dejiyo)? 7 Ama, Yaa yamayska hoos
u geli doona (inuu Masiix kuwa dhintay ka soo sara kiciyo)?
(Abyssos g12) 8 Laakiin maxay leedahay? Eraygii waa kuu
dhow yahay, waana ku jiraa afkaaga iyo qalbigaaga, waxaa
weeyaan erayga rumaysadka oo aannu kugu wacdinno.
9 Maxaa yeelay, haddaad afka ka qiratid in Ciise yahay
Rabbiga, oo aad qalbiga ka rumaysatid in Ilaah isaga ka sara
kiciyey kuwii dhintay, waad badbaadi doontaa, 10 waayo,
qalbiga wax baa laga rumaystaa xagga xaqnimada, afkana
wax baa laga qirtaa xagga badbaadinta. 11 Waayo, Qorniinku
wuxuu leeyahay, Ku alla kii rumaysta isaga, ceeboobi maayo.
12 Waayo, Yuhuudda iyo Gariigtu waxba kuma kala duwana,
waayo, isku Rabbi baa Rabbi u wada ah, waana u taajir
in alla intii barida isaga. 13 Waayo, ku alla kii magaca
Rabbiga ku baryaa, waa badbaadi doonaa. 14 Haddaba
sidee bay ugu baryi doonaan kan aanay rumaysnayn?
Oo sidee bay u rumaysan doonaan kan aanay maqlin?
Oo sidee bay u maqli doonaan haddii aan la wacdiyin?
15 Oo sidee bay u wacdiyi doonaan haddaan la dirin?
sida qoran, Qurux badanaa cagaha kuwa wax ku wacdiya
waxyaalaha wanaagsan. 16 Laakiin kulligood ma ay wada
dhegaysan injiilka. Waayo, Isayos wuxuu leeyahay, Rabbow,
yaa rumaystay warkayagii? 17 Haddaba rumaysadku wuxuu
ka yimaadaa maqlidda, maqlidduna waxay ku timaadaa
ereyga Masiixa. 18 Laakiin waxaan leeyahay, Miyaanay

maqlin? Haah, runtii. Codkoodii wuxuu gaadhay dhulka oo
dhan, Hadalkoodiina wuxuu gaadhay dunida meesha ugu
shishaysa. **19** Laakiin waxaan leeyahay, Miyaan reer binu
Israa'iil ogayn? Ugu horraystii Muuse wuxuu yidhi, Waxaan
idinkaga hinaasin doonaa kuwo aan quruun ahayn; Quruun
aan wax garanayn waan idinkaga cadhaysiin doonaa. **20**
Isayosna waa dhiirranaa oo wuxuu yidhi, Waxaa i helay
kuwo aan i doonayn, Waxaan u muuqday kuwo aan wax i
weyddiinayn. **21** Laakiin reer binu Israa'iil wuxuu ku yidhi,
Maalintii oo dhan waxaan gacmahayga u kala bixinayay dad
caasi ah oo muran miidhan ah.

**11** De waxaan leeyahay, Ilaah miyuu xooray dadkiisii? Ma
suurtowdo. Waayo, anba waxaan ahay mid reer binu
Israa'iil ah, oo farcankii Ibraahim ah, oo qabiilkii Benyaamiin
ah. **2** Ilaah dadkiisii uu hore u yiqiin ma xoorin. Mise ma
waydaan aqoon waxa Qorniinku ka sheegayo Eliyaas? siduu
Ilaah ugu cawday isagoo reer binu Israa'iil ka cabanaya
oo leh, **3** Rabbow, nebiyadaadii way dileen, meelahaagii
allabarigana way dumiyeen, oo keligay baa hadhay, oo
naftayday doondoonayaan. **4** Laakiinse jawaabtii Ilaah oo u
timid isaga maxay leedahay? Waxaan nafahaantayda ula
hadhay toddoba kun oo nin oo aan Bacal u jilba joogsan.
**5** Sidaas oo kale wakhtigan la joogona waxaa jira kuwo
hadhay oo nimco lagu doortay. **6** Laakiinse haddii nimco lagu
doortay, de haddaba ma aha mar dambe xagga shuqullada,
haddii kalese nimcadu mar dambe nimco ma aha. **7** Waa
maxay haddaba? Wixii reer binu Israa'iil doondoonayeen
ma ay helin, laakiinse kuwii la doortay waa heleen, intii
kalena waa la engejiyey, **8** sida qoran, Ilaah wuxuu iyaga
siiyey maskax hurudda, iyo indho aanay waxba ku arkin,
iyo dhego aanay waxba ku maqlin, ilaa maalintatan. **9**
Daa'uudna wuxuu yidhi, Miiskoodu ha u noqdo dabin iyo wax
qabsada iyaga, Iyo wax ay ku turunturoodaan, iyo wax ka
aarguta iyaga; **10** Indhahoodu ha madoobaadeen si aanay
waxba u arkin, Dhabarkoodana foorari weligiis. **11** Haddaba
waxaan leeyahay, Miyey turunturoodeen inay dhacaan?
Maya, ma suurtowdo! Laakiin dhicitinkoodii aawadiis ayaa
badbaadinu ugu timid quruumaha kale inay ka hinaasaan.
**12** Haddaba haddii dhicitinkoodii yahay taajirnimadii dunida,
liidnaantoodiina tahay taajirnimadii quruumaha kale, de
buuxnaantooduna intee bay sii badin doontaa taajirnimadii?
**13** Laakiin waxaan la hadlayaa kuwiinnan oo ka mid ah
dadka aan Yuhuudda ahayn. Haddaba anigoo ah rasuulkii
dadka aan Yuhuudda ahayn, hawshayda waan derejeeyaa,
**14** si aan uga hinaasiyo kuwa aan isku jidhka nahay oo
aan qaarkood badbaadiyo. **15** Waayo, haddii xooriddoodu
tahay maslaxadda dunida, aqbaliddoodii maxay noqon
doontaa, soo noolaadka kuwii dhintay mooyaane? **16** Inta
ugu horraysa oo cajiinku hadday quduus tahay, de cajiinkuna
wuu yahay, haddii xididku quduus yahayna, de laamahuna
way yihiin. **17** Laakiinse haddii laamihii qaarkood laga
jebiyey, oo adigoo saytuundibadeed ah lagugu tallaalo
meeshoodii, oo aad ka qayb gasho wanaagga xididka
geedka saytuunka ah, **18** ha ka faanin laamaha, laakiinse
haddii aad faantid, bal ogow inaadan ahayn kan xididka sida,
laakiinse xididkaa adiga ku sida. **19** Haddaba waxaad odhan
doontaa, Laamihii waxaa loo jebiyey in aniga laygu tallaalo
meeshoodii. **20** Waa tahay. Rumaysaddarradoodii baa loo
jebiyey, adna waxaad ku taagan tahay rumaysadkaaga.
Ha iskibrin, laakiinse cabso; **21** waayo, haddaan Ilaah u
tudhin laamihii asliga ahaa, de adna kuu tudhi maayo. **22**
Bal hadda fiiri roonaanta iyo adkaanta Ilaah; kuwii dhacay
xaggooda adkaantiisaa la jirta, laakiinse xaggaaga waxaa la
jirta roonaanta Ilaah, haddaad roonaantiisa ku sii socotid,
haddii kaleeto adna waa lagu gooyn doonaa. **23** Iyagana
haddayan rumaysaddarradoodii ku sii socon, waa lagu
tallaali doonaa meeshoodii, waayo, Ilaah waa awoodaa inuu
iyaga mar kale ku tallaalo meeshoodii. **24** Waayo, haddii
adiga lagaa soo gooyay saytuun dibadeed oo si aburiddiisa
ka gees ah laguugu tallaalay geed saytuun wanaagsan
ah, intee baa in ka sii badan kuwan oo ah laamihii asliga
ahaa loogu tallaali doonaa geedkoodii saytuunka ahaa? **25**
Walaalayaalow, anigu dooni maayo, inaad jaahil ka ahaataan
qarsoodigan, waabase intaas ood iskibrisaan. Adkaan aan
dhammayn baa ku dhacday reer binu Israa'iil ilaa tirada
buuxda oo quruumuhu soo gasho; **26** oo sidaasay reer binu
Israa'iil oo dhammu u wada badbaadi doonaan, sida qoran,
Waxaa Siyoon ka soo bixi doona Bixiyaha. Wuxuu Yacquub
ka sii jeedin doonaa cibaadola'aanta. **27** Oo kanu waa
axdigayga aan la dhigan doono iyaga, Markaan dembigooda
ka qaadi doono. **28** Xagga injiilka iyagu waa cadaawayaal
aawadiin, laakiinse xagga doorashada waa kuwo la jecel
yahay awowayaasha aawadood. **29** Waayo, hadiyadaha iyo
yeedhidda Ilaah ka soo noqosho ma leh. **30** Waayo, idinkuba
mar baad Ilaah caasi ku ahaydeen, laakiinse haatan waxaa
laydiinku naxariistay kuwaas caasinimadooda, **31** sidaas
oo kalay iyaguna haatan caasi u noqdeen, in naxariistii
laydin tusay, iyagana haatan loogu naxariisto. **32** Waayo,
Ilaah kulli wuxuu ku wada xidhay caasinimo inuu u wada
naxariisto kulli. **(eleēsē g1653)** **33** Mool dheeraa hodantinimada
iyo xigmadda iyo aqoonta Ilaah! Xukummadiisa lama baadhi
karo, jidadkiisana lama raadin karo! **34** Waayo, bal yaa soo
ogaaday maanka Rabbiga? Bal yaase lataliyihiisii noqday?

35 Yaase awil wax siiyey oo loo abaalgudi doonaa? 36
Waayo, wax waluba isagay ka yimaadeen oo ku yimaadeen
oo u yimaadeen aawadiis. Ammaanta isagaa leh weligiis.
Aamiin. (aiōn g165)

12 Haddaba, walaalayaalow, waxaan idinku baryayaa
Ilaah naxariistiisa inaad jidhkiinna Ilaah u siisaan
sida allabari nool oo quduus ah oo Ilaah ku farxo, waana
cibaadaysigiinna caqliga leh. 2 Ha u ekaanina dadka ifkan,
laakiinse ku beddelma cusboonaanta maankiinna inaad
hubsataan waxa ay tahay doonista Ilaah oo wanaagsan oo
isagu ku farxo oo kaamilka ah. (aiōn g165) 3 Waayo, nimcadii
lay siiyey ayaan ku hadlayaa, waxaan ku leeyahay, Mid
kasta oo idinka mid ah, yuusan isderejayn intuu isderejayn
lahaa in ka badan, laakiinse miyirqab ha ku fikiro, sida Ilaah
mid kasta u siiyey qayb rumaysad ah. 4 Waayo, sida aynu
xubno badan ugu leennahay jidhkeenna, oo aan xubnaha oo
dhammuna isku shuqul u ahayn, 5 sidaas oo kalaan, innagoo
badan, Masiixa isku jidh ku nahay, oo midba midka kale waa
xubnihiisii. 6 Innagoo haysanna hadiyado ku kala duwan
nimcadii layna siiyey, hadday tahay wax sii sheegid, aan wax
ku sii sheegno sida qaybta rumaysadkeenna. 7 Ama hadday
tahay adeegid, aan aad u adeegno; kii wax baraana, si fiican
wax ha u baro; 8 kii wax waaniyaana, si fiican wax ha u
waaniyo; kii wax bixiyaana, deeqsinimo wax ha u bixiyo;
kii wax u taliyaana, dadaal wax ha ugu taliyo; kii wax u
naxariistaana, farxad wax ha ugu naxariisto. 9 Jacaylku ha
noqdo mid aan labaweji lahayn, sharka karha, wanaagga
xagsada. 10 Kalgacayl walaalnimo isku wada jeclaada,
midkiinba midka kale ha hor derejeeyo. 11 Dadaalka ha ka
caajisina, ruuxa ku kululaada, oo Rabbiga u adeega. 12
Rajada ku farxa, dhibta u dulqaata, tukashada wadiddeeda
ku sii adkaysta, 13 oo ku caawiya waxa quduusiintu u baahan
yihiin, oo shisheeyaha martiggeliya. 14 U duceeya kuwa
idin silciya, u duceeya, oo ha habaarina. 15 La farxa kuwa
farxaya, la ooya kuwa ooyaya. 16 Midba midka kale ha la
fikir ahaado, ha kibrina, laakiin kuwa hoose la socda. Kuwo
isla caqli badan ha noqonina. 17 Ninna shar shar ha uga
celinina. Ka fikira inaad samaysaan waxa wanaagsan dadka
oo dhan hortiisa. 18 Hadday suurtowdo, intaad kartaan,
nabad kula jooga dadka oo dhan. 19 Gacaliyayaalow, ha
aarsanina, laakiin meel u banneeya cadhada Ilaah, waayo,
waxaa qoran, Aarsasho anigaa leh; anaa u abaalmarin,
ayaa Rabbigu leeyahay. 20 Laakiin haddii cadowgaagu
gaajaysan yahay, cunto sii; hadduu harraadsan yahayna,
waraabi, waayo, haddaad saas samayso waxaad madaxiisa
ku kor ururin doontaa duxulo dab ah. 21 Sharku yuusan kaa
adkaan, laakiinse sharka wanaag kaga adkow.

13 Naf waluba ha ka dambayso kuwa amarka sare leh,
waayo, amar ma jiro kan Ilaah ka yimaada mooyaane.
Kuwa jirana Ilaah baa ka dhigay kuwa amar leh. 2 Sidaas
daraaddeed kii diida kan amarka leh wuxuu hor joogsadaa
amarka Ilaah, kuwa hor joogsadaana waxay nafahaantooda
u heli doonaan xukun. 3 Madaxdu cabsi ma geliyaan
kuwa shuqul wanaagsan sameeya, kuwa xumaan sameeya
mooyaane. Ma waxaad doonaysaa inaadan ka cabsan kan
amarka leh? Wax wanaagsan samee, oo ammaan baad ka
helaysaa isla isaga. 4 Waayo, isagu wuxuu xaggaaga ku
yahay midiidinka Ilaah inuu wanaag kuu sameeyo. Laakiinse
haddaad xumaan samaysid, cabso, waayo, isagu seefta
uma sito sababla'aan. Maxaa yeelay, isagu waa midiidinka
Ilaah, oo waa mid cadho kaga aarsada kii xumaan sameeya.
5 Sidaas daraaddeed waa in laga dambeeyo kan amarka
leh, mana aha cadhada aawadeed oo keliya, laakiinse
waa niyadda aawadeedna. 6 Waayo, sababtaas aawadeed
waxaad u bixisaan cashuur, maxaa yeelay, iyagu waa
midiidinnadii Ilaah oo had iyo goor ka shaqeeya isla waxaas.
7 Mid waluba wuxuu idinku leeyahay siiya, kii baad idinku
leh, baad siiya, kii cashuur idinku leh, cashuur siiya, kii laga
cabsadana, ka cabsada, kii ciso lehna, ciseeya. 8 Ninna
yuusan wax idinku lahaan in midkiinba midka kale jeclaado
mooyaane. Waayo, kii deriskiisa jeclaadaa sharciguu oofiyey.
9 Waayo, amarradan la yidhi, Waa inaanad sinaysan, Waa
inaanad qudh gooyn, Waa inaanad waxba xadin, Waa
inaanad wax damcin, oo haddii amar kale jirana, waxaa lagu
soo koobay hadalkan, Waa inaad deriskaaga u jeclaataa sida
naftaada. 10 Jacaylku xumaan kuma sameeyo deriskiisa;
jacaylku haddaba waa oofinta sharciga. 11 Oo weliba waad
garanaysaan wakhtiga inay haatan tahay saacaddii aad
hurdada ka toosi lahaydeen, waayo, haatan ay badbaadintu
inooga dhow dahay markii horoo aan rumaysannay. 12
Habeenkii hore buu u batay, maalintiina waa soo dhowaatay,
sidaas daraaddeed aan iska dhigno shuqullada gudcurka
oo aan qaadanno hubka iftiinka. 13 Sida iyadoo maalin
ah aynu si qumman u soconno, yeynan ku socon rabshad
iyo sakhraannimo, yeynan ku socon galmo iyo dhillanimo,
yeynan ku socon ilaaq iyo hinaaso. 14 Laakiin Rabbi Ciise
Masiix huwada, oo jidhka ha ka fikirina inaad damacyadiisa
samaysaan.

14 Kii rumaysadka ku itaal yar soo dhoweeya, mana aha
inaad ra'ayiyadiisa la murantaan. 2 Mid baa rumaysan
inuu wax walba cuno, kii itaal yarse wuxuu cunaa khodaarta.

3 Kii cunaa yuusan quudhsanin kii aan cunin, kii aan cuninna
yuusan xukumin kii cuna, waayo, Ilaah baa aqbalay isaga. 4
Yaad tahay kaaga xukuma midiidinka mid kaleto? Waayo,
sayidkiisuu u taagan yahay ama u dhacaa. Waana la taagi
doonaa, waayo, Rabbigu waa awoodaa inuu taago. 5 Nin
bay la tahay in maalinu maalinta kale ka fiican tahay, mid
kalena waxay la tahay in maalmaha oo dhammu isku mid
yihiin. Mid kastaaba maankiisa aad ha ugu hubsado. 6 Kii
maalinta ka fikiraa, Rabbiguu uga fikiraa, kii wax cunaa,
Rabbiguu u cunaa, waayo, Ilaah buu ku mahadnaqaa; kii aan
wax cuninuna, Rabbiga ayuusan u cunin, oo Ilaah buu ku
mahadnaqaa. 7 Midkeenna naftiisa uma noola, midkeenna
naftiisa uma dhinto. 8 Waayo, haddii aynu nool nahay,
Rabbigaynu u nool nahay; oo haddii aynu dhimannona,
Rabbigaynu u dhimannaa, sidaas daraaddeed haddii aynu
nool nahay iyo haddii aynu dhimannoba, Rabbigaa ina
leh. 9 Waayo, sababtaasaa Masiixu u dhintay, una soo
noolaaday inuu Rabbi u noqdo kuwii dhintay iyo kuwa
noolba. 10 Adigu maxaad walaalkaa u xukuntaa? amase
adigu maxaad walaalkaa u quudhsataa? Waayo, kulligeen
waxaynu hor istaagi doonnaa kursiga xukumaadda Ilaah. 11
Waayo, waxaa qoran, Anigu waa noolahay, ayaa Rabbigu
leeyahay, oo jilib waluba anuu ii sujuudi doonaa, Carrab
walubana Ilaah buu qiri doonaa. 12 Sidaasaa midkeen
kastaba Ilaah ula xisaabtami doonaa. 13 Sidaas daraaddeed
mar dambe yeynan isxukumin, laakiinse tan ka fikira inaan
ninna walaalkiis u dhigin dhagax uu ku turunturoodo ama
wax kaleeto oo hor joogsada. 14 Waan ogahay, waanan ku
hubaa Rabbi Ciise, inaan waxba nafahaantiisa iska xaaraan
ahayn, laakiinse kii ku tiriya inay xaaraan tahay, kaas waa
ka xaaraan. 15 Waayo, haddii walaalkaa cuntadaada ka
calool xumaado, jacaylka kuma sii socotid. Cuntadaada ha
ku baabbi'in kii Masiixu u dhintay. 16 Haddaba wanaaggiinna
yaan la caayin. 17 Waayo, boqortooyada Ilaah ma aha
cunid iyo cabbid, laakiinse waa xaqnimada iyo nabadda iyo
farxadda ku jira Ruuxa Quduuskaa. 18 Kii waxaas Masiixa
ugu adeega, Ilaah buu ka farxiyaa, xagga dadkana waa mid
loo bogay. 19 Sidaas daraaddeed haddaba aynu raacno
waxyaalaha nabadda iyo waxyaalaha midkeenba midka
kale xoog ugu yeelo. 20 Shuqulka Ilaah ha u dumin cunto
aawadeed. Hubaal wax waluba waa nadiif, laakiin waa u
xun tahay kii cuna isagoo mid kale xumaynayo. 21 Waa
wanaagsan tahay inaadan hilib cunin ama khamri cabbin
ama samayn wax kaleto oo walaalkaa ku turunturoodo. 22
Rumaysadka aad leedahay, Ilaah hortiis u hayso. Waxaa
faraxsan kii aan isku xukumin wixii la qumman isaga. 23
Laakiinse kii shakiya, hadduu cuno, waa xukuman yahay,
maxaa yeelay, rumaysad wax kuma cuno, oo wax kastoo
aan rumaysadka ka imaninu waa dembi.

15 Kuweenna xoogga leh waxaa inagu waajib ah inaynu
qaadno itaaldarrada kuwa xoogga yar, oo aynaan
nafteenna ka farxin. 2 Midkeen kastaaba deriskiisa ha ka
farxiyo inuu ku wanaagsanaado oo ku dhismo. 3 Waayo,
Masiixiiba naftiisii kama uu farxin, laakiinse sida qoran,
Caydii kuwii adiga ku caayay ayaa igu kor dhacday. 4
Waayo, wax alla wixii hore loo qorayba waxaa loo qoray
waxbarashadeenna, inaynu dulqaadashada iyo gargaarka
Qorniinka rajo ku lahaanno. 5 Ilaaha dulqaadashada iyo
gargaariddu ha ka dhigo in midkiinba midka kale la fikir ahaado
sida Ciise Masiix, 6 inaad isku qalbi iyo isku af ku ammaantaan
Ilaaha ah Aabbaha Rabbigeenna Ciise Masiix. 7 Sidaas
daraaddeed isdhoweeya sida Masiixuna idiin dhoweeyey
in Ilaah la ammaano. 8 Waayo, waxaan idinku leeyahay,
Masiixu wuxuu noqday kuwa gudan midiidinkooda, runta
Ilaah aawadeed, inuu u xaqiijiyo ballamadii awowayaashii
hore la siiyey, 9 iyo in quruumuhu Ilaah u ammaanaan
naxariistiisa, sida qoran, Sidaas daraaddeed waxaan kugu
ammaani doonaa quruumaha dhexdooda, Oo magacaaga
waan u gabyi doonaa. 10 Oo haddana wuxuu leeyahay,
Quruumahow, la reyreeya dadkiisa. 11 Oo haddana, Rabbiga
ammaana, quruumahoo dhammow, Dadkoo dhammuna ha
ammaano isaga. 12 Oo haddana Isayos wuxuu leeyahay,
Waxaa jiri doona xididkii Yesay, Iyo kan u kacaya inuu u taliyo
quruumaha, Isagayna quruumuhu wax ku rajayn doonaan.
13 Ilaaha rajadu ha idinka buuxiyo farxad iyo nabad oo dhan,
idinkoo rumaysan, si rajadiinnu ugu badato xoogga Ruuxa
Quduuskaa. 14 Oo aniga qudhayduna waxaan idiin hubaa,
walaalahayow, inuu wanaag idinka buuxo, oo laydinka
buuxiyey aqoon oo dhan, oo aad kartaan inaad iswaanisaan.
15 Laakiinse siyaalaha qaarkood dhiirranaan badan baan
idiinku soo qoray inaan idin xusuusiyo, nimcadii xagga Ilaah
layga siiyey aawadeed, 16 inaan dadka aan Yuhuudda
ahayn u noqdo midiidinkii Ciise Masiix, anigoo shuqulka
wadaadnimada u qabanaya injiilka Ilaah, in sadaqada
dadka aan Yuhuudda ahayn la aqbalo, iyadoo quduus
lagaga dhigay Ruuxa Quduuskaa. 17 Haddaba xagga Ciise
Masiix waxaan leeyahay wax aan ku faano, waana wax ku
saabsan Ilaah. 18 Waayo, kuma dhici doono inaan waxba
ka hadlo wixii Masiixii iga dhex shaqeeyey mooyaane,
dadka aan Yuhuudda ahayn addeeciddooda aawadeed,
oo uu igaga dhex shaqeeyey hadal iyo camal, 19 oo uu
ku sameeyey xoogga calaamooyinka iyo yaababka, iyo
xoogga Ruuxa Quduuskaa, oo sidaasaan injiilka Masiixa

ugu wada wacdiyey Yeruusaalem iyo hareeraheeda iyo
ilaa Illurikon. **20** Sidaasaan u hawaystay inaan injiilka ku
wacdiyo meel aan Masiixa awil lagu magacaabin, si aanan
ugu dul dhisin aasaaska nin kale dhigay. **21** Laakiinse, sida
qoran, Waxaa arki doona kuwo aan warkiisu u iman, Kuwii
aan maqlinuna waa garan doonaan. **22** Sidaas daraaddeed
marar badan baa layga hor joogsaday imaatinkii aan idiin
iman lahaa; **23** laakiinse haatan anigoo aan meelahakan
meel dambe ku lahayn, oo idin boholyoobayay sannado
badan inaan idiin imaado, **24** markaan Isbaanya tago
waxaan rajaynayaa inaan sodcaalkayga idinku arko oo idinna
aad halkaas iga ambabbixisaan, markaan cabbaar idinku
raaxaysto dabadeed, **25** laakiinse haatan waxaan aadayaa
Yeruusaalem inaan u adeego quduusiinta. **26** Waayo, dadka
Makedoniya iyo Akhaya waxay aad u jeclaysteen inay
wax u ururiyaan masaakiinta ka midka ah quduusiinta
Yeruusaalem joogta. **27** Way jeclaysteen, waana ku waajib
inay sameeyaan. Waayo, dadka aan Yuhuudda ahayn
hadday noqdeen kuwo ka qayb galay waxyaalahooda ruuxa,
de markaas waxaa ku waajib ah iyaga inay ugu adeegaan
waxyaalaha jidhka. **28** Sidaas daraaddeed markaan tan
dhammeeyo oo aan iyaga midhahan ku hubsado, idinkaan
idin soo mari doonaa, anoo Isbaanya u socda. **29** Oo
waxaan ogahay markaan idiin imaado inaan ku iman doono
buuxnaanta barakada Masiixa. **30** Walaalayaalow, waxaan
idinku baryayaa Rabbigeenna Ciise Masiix iyo jacaylka
Ruuxa, inaad igula dadaashaan tukashooyinkiinna markaad
Ilaah ii baridaan, **31** in layga samatabbixiyo kuwa caasiyiinta
ah oo Yahuudiya jooga, iyo in hawshayda aan Yeruusaalem
u qabanayo ay noqoto mid ay quduusiintu aqbalaan; **32**
inaan farxad idiinku imaado haddii Ilaah doonayo, oo aan
idinla nasto. **33** Ilaaha nabaddu ha idinla jiro kulligiin. Aamiin.

**16** Waxaan idin barayaa walaasheen Foybi oo ah mid u
adeegta kiniisadda ku taal Kenekhreya, **2** inaad iyada
ku dhowaysaan Rabbiga, sida quduusiinta u eg, oo aad ku
caawintaan wax kasta oo ay idiinka baahan tahay, waayo,
iyaduba kuwa badan bay caawintay iyo xataa aniga qudhayda.
**3** Igu salaama Bariska iyo Akula kuwa iila shaqeeya Ciise
Masiix, **4** oo noloshayda aawadeed qoortooda u dhibay.
Keligay uma mahadnaqayo, laakiinse kiniisadaha dadka aan
Yuhuudda ahayn oo dhammuna ay ku mahadnaqayaan. **5**
Iguna salaama kiniisadda gurigooda ku jirta. Igu salaama
gacaliyahay Ebaynetos, kan ah midhaha ugu horreeya ee
Aasiya xagga Masiixa. **6** Maryanna igu salaama, tan aad
idiinku dadaashay. **7** Igu salaama Andaronikos iyo Yuniyas
oo xigaalkayga ah oo layla xidhay, kuwa caanka ku ah
rasuullada dhexdooda, kuwa hortayna Masiixa ku jiray. **8**
Ambaliyas, gacaliyahayga xagga Rabbigana igu salaama.
**9** Urbanos kan Masiixa noola shaqeeya iyo gacaliyahay
Istakhusna igu salaama. **10** Abellees kan Masiixu u bogayna
igu salaama. Kuwa reer Aristobulosna igu salaama. **11**
Xigaalkay Herodiyosna igu salaama. Iguna salaama kuwa
reer Narkisos oo Rabbiga ku jira. **12** Tarufayna iyo Tarufoosa
oo Rabbiga u shaqeeyana igu salaama. Gacaliso Bersis oo
Rabbiga aad ugu shaqaysayna igu salaama. **13** Igu salaama
Rufus kan Rabbigu doortay iyo hooyadiis oo hooyaday
oo kale ah. **14** Igu salaama Asunkiritos, iyo Filegoon,
iyo Hermees, iyo Batrobas, iyo Hermaas, iyo walaalaha
iyaga la jooga. **15** Igu salaama Filologos, iyo Yulya, iyo
Neere'us, iyo walaashiis, iyo Olumbas, iyo quduusiinta iyaga
la jooga oo dhan. **16** Midkiinba midka kale ha ku salaamo
dhunkasho quduus ah. Kiniisadihii Masiixa oo dhammu waa
idin soo salaamayaan. **17** Haddaba walaalayaalow, waxaan
idinka baryayaa inaad fiiro u lahaataan kuwa kicinaya
iskala qaybinta iyo xumaatooyinka oo ka geesta ah cilmiga
aad barateen, kana leexda iyaga. **18** Kuwa caynkaas ahu
Rabbigeenna Masiix uma adeegaan, laakiinse waxay u
adeegaan calooshooda; hadalkooda macaan oo wanaagsan
bay ku khiyaaneeyaan qalbiyada jaahiliinta. **19** Warkii
addeeciddiinnu wuxuu gaadhay dadka oo dhan. Sidaas
daraaddeed aad baan idiinku faraxsanahay, laakiin waxaan
jeclaan lahaa inaad garaad u lahaataan waxa wanaagsan,
oo aad ka eedla'aataan waxa sharka ah. **20** Oo Ilaaha
nabaddu Shayddaan buu haddiiba cagihiinna hoostooda
ku burburin doonaa. Nimcada Rabbigeenna Ciise Masiix
ha idinla jirto. **21** Waxaa idin soo salaamaya Timoteyos
oo ila shaqeeya, iyo Lukiyos, iyo Yasoon, iyo Soosibater,
iyagoo ah xigaalkayga. **22** Anigoo Tertiyos ah oo warqaddan
qoray, Rabbigaan idinku salaamayaa. **23** Gayos, oo aniga
iyo kiniisadda oo dhammuba aannu marti u nahay, wuu
idin soo salaamayaa. Erastos oo ah qasnajiga magaalada,
iyo walaalkeen Kowartos way idin soo salaamayaan. **24**
Nimcada Rabbigeenna Ciise Masiix ha idinla jirto kulligiin.
Aamiin. **25** Haddaba ammaanu ha u ahaato kan kara inuu
idinku xoogeeyo injiilkayga iyo wacdiga ku saabsan Ciise
Masiix iyo muujinta qarsoodiga oo qarsoonaa tan iyo weligiis,
**(aiōnios g166)** **26** laakiinse haatan lagu muujiyey Qorniinka
nebiyada sida amarka Ilaaha daa'imka ah oo quruumaha oo
dhan loo ogeysiiyey inay addeecaan rumaysadka. **(aiōnios
g166)** **27** Ilaaha keligiis ah oo xigmadda leh, Ciise Masiix
ammaanu ha ugu ahaato weligiis. Aamiin. **(aiōn g165)**

# 1 Korintos

**1** Bawlos oo loogu yeedhay inuu doonistii Ilaah ku ahaado
rasuulkii Ciise Masiix, iyo walaalkeen Soostenees, **2**
waxaannu warqaddan u qoraynaa kiniisadda Ilaah ee
Korintos ku taal, kuwa quduus lagaga dhigay Ciise Masiix ee
loogu yeedhay quduusiin, iyo kuwa meel kasta jooga oo ku
barya magaca Rabbigeenna Ciise Masiix oo ah Rabbigooda
iyo keennaba. **3** Nimco ha idinla jirto iyo nabad ka timaada
Ilaaha Aabbeheen ah iyo Rabbi Ciise Masiix. **4** Mar kasta
Ilaahay ayaan idiinku mahadnaqaa, nimcadii Ilaah ee Ciise
Masiix laydinku siiyey aawadeed. **5** Maxaa yeelay, wax
walba hodan buu idinkaga dhigay, ha ahaato hadal walba
iyo aqoon walbaba, **6** sida laydiinku adkeeyey maraggii
Masiixa loo furay; **7** si aan hadiyadiinna idiinka dhinmin
intaad sugaysaan muujinta Rabbigeenna Ciise Masiix; **8**
kan haddana idinku adkayn doona ilaa dhammaadka, inaad
eedla'aataan maalinta Rabbigeenna Ciise Masiix. **9** Ilaah waa
aamin, kan xaggiisa laydiinku yeedhay xidhiidhka Wiilkiisa
Ciise Masiix ee Rabbigeenna ah. **10** Walaalayaalow, waxaan
magaca Rabbigeenna Ciise Masiix idinkaga baryayaa inaad
dhammaantiin isku wax ku wada hadashaan, iyo inaydnaan
kala qaybsamin, laakiin inaad ku dhammaataan isku maan
iyo isku talo. **11** Walaalahayow, dadkii Khalo'ee ayaa iiga kiin
warramay in ilaaqi idin dhex taal. **12** Tan waxaan ula jeedaa
midkiin inuu leeyahay, Waxaan ka mid ahay kuwa Bawlos;
mid kalena, Kuwa Abolloos; mid kalena, Kuwa Keeyfas;
mid kalena, Kuwa Masiix. **13** Masiixu miyuu qaybsamaa?
Bawlos miyaa iskutallaabta laydiinku qodbay? Ama ma
waxaa laydinku baabtiisay magaca Bawlos? **14** Waxaan
Ilaah ugu mahadnaqayaa inaanan midkiinna baabtiisin,
Kirisbos iyo Gayus maahee **15** inaanu ninna odhan, Waxaa
laydinku baabtiisay Bawlos magiciisa. **16** Waxaan kaloo
baabtiisay kuwii guriga Istefanas joogay. Weliba garan
maayo inaan qaar kale baabtiisay iyo in kale. **17** Waayo,
Masiixu iima uu soo dirin inaan dad baabtiiso, laakiin wuxuu
ii soo diray inaan dadka injiilka ku wacdiyo, ee ma aha inaan
ku hadlo xigmadda hadalka, waaba intaasoo iskutallaabta
Masiixa la caaqibo tiraaye. **18** Waayo, hadalka ku saabsan
iskutallaabtu waa u nacasnimo kuwa lumaya, laakiin waa
u xoogga Ilaah kuweenna badbaadaya. **19** Maxaa yeelay,
waxaa qoran, Xigmadda kuwa xigmadda leh waan baabbi'in
doonaa, Oo garashada kuwa garashada leh ayaan diidi
doonaa. **20** Meeh kan xigmadda lihi? Meeh kan culimmada
ka mid ahi? Meeh kan wakhtigan muranka badani? Ilaah
miyaanu nacasnimo ka dhigin xigmadda dunida? **(aiōn g165)**
**21** Dunidu Ilaah kuma ay garanaynin xigmaddeeda, laakiin
Ilaah xigmaddiisa aawadeed ayuu ku farxay inuu kuwa
rumaysta ku badbaadiyo nacasnimadii wacdiga. **22** In kastoo
ay Yuhuuddu calaamooyin doonaan oo Gariigtuna ay xigmad
doonaan, **23** annaguse waxaannu dadka ku wacdinnaa
Masiix oo iskutallaabta lagu qodbay, oo u ah xagga Yuhuudda
wax lagu turunturoodo, xagga Gariigtana u ah nacasnimo.
**24** Xagga kuwa loo yeedhayse, ha ahaadeen Yuhuudda
ama Gariigta, Masiix baa u ah xoogga Ilaah iyo xigmadda
Ilaah. **25** Waayo, nacasnimada Ilaah waa ka xigmad badan
tahay xigmadda dadka, oo itaaldarrada Ilaahna waa ka itaal
badan tahay itaalka dadka. **26** U fiirsada waxa laydiinku
yeedhay, walaalayaalow, sidaan loogu yeedhin qaar badan
oo xigmad leh xagga jidhka, ama qaar badan oo xoog leh,
ama qaar badan oo gob ah, **27** laakiinse Ilaah wuxuu doortay
waxyaalaha nacasnimada ah ee dunida inuu ceebeeyo kuwa
xigmadda leh, oo Ilaah baa doortay waxyaalaha itaalka
daran inuu ceebeeyo waxyaalaha itaalka leh. **28** Waxyaalaha
hoose iyo waxyaalaha la fududaystana Ilaah baa doortay,
xataa waxyaalaha aan jirin, inuu waxyaalaha jira wax aan
wax tarin ka dhigo, **29** si aan qofna ugu faanin Ilaah hortiisa.
**30** Laakiin xaggiisa waxaad ku jirtaan Ciise Masiix kan
inoo noqday xigmadda xagga Ilaah, iyo xaqnimada, iyo
quduusnaanta, iyo madaxfurashada, **31** in sida qoran, Kii
faanaa, Rabbiga ha ku faano.

**2** Walaalayaalow, anna markaan idiin imid, lama iman
hadal wanaaggiis ama xigmad, anoo idinku wacdiyaya
maraggii laga furay Ilaah, **2** waayo, waxaan goostay
inaanan waxba dhexdiinna ka ogaan Ciise Masiix oo ah
kan iskutallaabta lagu qodbay maahee. **3** Oo waxaan
idinkula joogay itaaldarro, iyo cabsi, iyo gariir badan. **4**
Laakiin hadalkayga iyo wacdigayga kuma aan hadlin hadallo
sasabasho iyo xigmad ah, laakiin waxaan ku hadlay tusidda
Ruuxa iyo xoogga, **5** inaan rumaysadkiinnu ku tiirsanaan
xigmadda dadka, laakiin inuu xoogga Ilaah ku tiirsanaado.
**6** Waxaannu xigmadda kula hadallaa kuwa garashadu ku
dhan tahay, taasoo aan ahayn xigmadda wakhtigan, oo
aan ahayn xigmadda madaxda wakhtigan oo ah kuwa la
baabbi'in doono; **(aiōn g165)** **7** laakiin qarsoonaan ayaannu
ugu hadallaa xigmadda Ilaah oo la qariyey, oo Ilaah dunida
horteed ka dhigay ammaanteenna aawadeed, **(aiōn g165)**
**8** tan madaxda wakhtigan midkoodna aanu garanaynin,
waayo, hadday garan lahaayeen, iskutallaabta kuma ay
qodbeen Rabbiga ammaanta, **(aiōn g165)** **9** laakiin sida qoran,
Waxyaalo aanay ishu arkin, oo aanay dhegtu maqlin, Oo
aan qalbiga dadka gelin, Wax kastoo ay yihiinba, Ilaah baa u
diyaariyey kuwa isaga jecel. **10** Innagase Ilaah baa inoogu

muujiyey Ruuxa, waayo, Ruuxu wuxuu baadhaa wax kasta, xataa waxyaalaha hoos u dhaadheer oo Ilaah. **11** Waayo, dadka dhexdood yaa garanaya nin waxyaalihiisa, ruuxa ninka ku jira mooyaane? Sidaas oo kalena ninna garan maayo waxyaalaha Ilaah, Ruuxa Ilaah mooyaane. **12** Laakiin innagu ma aynu helin ruuxa dunida laakiinse Ruuxa Ilaah ka yimid, inaynu garanno waxyaalaha uu Ilaah nimco ahaan inoo siiyey. **13** Waxyaalahaasna ayaannu ku hadalnaa, kumase hadalno hadallo la baro ee ah xigmadda dadka, laakiin waxa Ruuxu baro, annaga oo waxyaalaha ruuxa ah ku simayna waxyaalaha ruuxa ah. **14** Ninka nafta raacaa ma aqbalo waxyaalaha Ruuxa Ilaah, waayo, nacasnimo bay u yihiin, mana garan karo, maxaa yeelay, ruuxa ayaa lagu imtixaamaa. **15** Kii ruuxa raacaa wax walbuu imtixaamaa, laakiinse isaga qudhiisa ninna ma imtixaamo. **16** Waayo, yaa gartay maanka Rabbiga inuu wax baro isaga? Laakiin annagu waxaannu leennahay maanka Ciise.

**3** Anna, walaalayaalow, idiinlama aan hadli karin sida idinkoo ruuxa raaca, laakiin idinkoo jidhka raaca sida kuwo ilmo yaryar ah oo ku jira Masiix. **2** Waxaan idin siiyey caano ee idinma aan siin cunto, waayo, weli ma aydaan cuni karin, haatanna weli ma aad kartaan. **3** Maxaa yeelay, weli jidhkaad raacdaan, waayo, intii xaasidnimo iyo ilaaq dhexdiinna ku jiraan, miyaanaydin jidhka raacsanayn oo sida dadka miyaanaydin u soconayn? **4** Waayo, markii mid yidhaahdo, Anigu waxaan ka mid ahay kuwa Bawlos, mid kalena, Anna Abolloos, miyaanaydin dad ahayn? **5** Haddaba muxuu yahay Abolloos? Bawlosna muxuu yahay? Waxay yihiin midiidinyadii aad xaggooda ku rumaysateen, oo mid kasta sida Rabbigu u siiyey isaga. **6** Anigu waan beeray, Abolloosna wuu waraabiyey, laakiin Ilaah baa koriyey. **7** Taa aawadeed waxba ma aha kan beeraa, ama kan waraabiyaa, laakiin waa Ilaah kan koriyaa. **8** Kan beeraa iyo kan waraabiyaa waa isku mid, laakiin mid kastaa wuxuu heli doonaa abaalkiis siday hawshiisu ahayd. **9** Waxaannu nahay kuwa Ilaah la shaqeeya, idinkuna waxaad tihiin beerta Ilaah iyo Ilaah dhismihiisa. **10** Sida dhise xigmad leh waxaan aasaaskii ku dhigay nimcadii Ilaah i siiyey, oo mid kalena wuu ka dul dhisayaa. Laakiin mid kastaa ha ka fiirsado siduu uga dul dhisayo. **11** Waayo, ninna ma dhigi karo aasaas kale kan la dhigay mooyaane oo ah Ciise Masiix. **12** Laakiin nin hadduu aasaaska ku dul dhiso dahab, ama lacag, ama dhagaxyo qaali ah, ama qoryo, ama caws, ama bal, **13** nin kasta shuqulkiisa ayaa la muujin doonaa. Waayo, maalintu way caddayn doontaa, maxaa yeelay, dab baa lagu muujiyaa, waayo, nin kasta shuqulkiisa caynkuu yahay dabka ayaa tijaabin doona. **14** Nin uun haddii shuqulkiisuu ku dul dhisay hadho, abaal buu heli doonaa. **15** Nin uun haddii shuqulkiisu gubto, wuu khasaari doonaa, isaga qudhiisuse wuu badbaadi doonaa, laakiin sidii wax dab laga soo baxshay oo kaluu u badbaadi doonaa. **16** Miyaanaydin garanaynin inaad tihiin macbudkii Ilaah oo uu Ruuxa Ilaah idinku jiro? **17** Nin uuni hadduu macbudka Ilaah kharribo, isaga Ilaah baa kharribi doona, waayo, macbudkii Ilaah waa quduus, kaad idinku tihiin. **18** Ninna yuusan iskhiyaanayn. Haddii nin dhexdiinna joogaa uu u malaynayo inuu wakhtigan xigmad leeyahay, doqon ha noqdo si uu xigmad u yeesho. **(aiōn g165)** **19** Waayo, xigmadda dunidan doqonnimay la tahay Ilaah. Waayo, waxaa qoran, Isagu kuwa xigmadda leh ayuu khiyaanadooda ku qabtaa, **20** oo haddana, Rabbigu waa garanayaa tashiyada kuwa xigmadda leh inayan waxba tarin. **21** Taa aawadeed ninna yaanu dadka ku faanin. Waayo, wax walba idinkaa leh, **22** ha ahaadeen ama Bawlos, ama Abolloos, ama Keeyfas, ama dunida, ama nolosha, ama dhimashada, ama waxyaalaha haatan jooga, ama waxyaalaha iman doona, dhammaan idinkaa leh. **23** Idinkuna kuwa Masiix baad tihiin, Masiixuna waa kan Ilaah.

**4** Ha lanagu tiriyo inaannu nahay midiidinyada Masiixa iyo wakiillada waxyaalaha qarsoon ee Ilaah. **2** Haddaba waxaa laga doonayaa wakiillada in aamin laga helo. **3** Laakiin waa ila yar tahay inaad idinku i xukuntaan ama in dad kale i xukumo; xataa aniga qudhaydu isma xukumo. **4** Waayo, waxba iskuma ogi, laakiinse ma aha taas aawadeed in xaq layga dhigay, waayo, waa Rabbiga kan i xukumaa. **5** Taa aawadeed wakhtiga hortiisa waxba ha xukumina ilaa Rabbigu imanayo, kan waxyaalaha qarsoon ee gudcurka iftiimin doona oo muujin doona tashiyada qalbiga, oo markaas nin kastaaba wuxuu ammaantiisa ka heli doonaa Ilaah. **6** Haddaba, walaalayaalow, waxyaalahan ayaan aawadiin u soo qaaday qudhayda iyo Abolloosba, inaad xaggayaga ka barataan inaydnaan ka gudbin waxyaalaha qoran oo aan midkiinna midka kale u faanin. **7** Waayo, yaa kaa soocay? Maxaad haysataa oo, aanad helin? Laakiin haddaad heshay, bal maxaad u faanaysaa sidii adigoo aan helin? **8** Horaad u dheregteen, horaad hodan u noqoteen, la'aantayo sida boqorro ayaad wax u xukunteen. Waan jeclaan lahaa inaad wax xukuntaan, inaannu annaguna wax idinla xukunno. **9** Waayo, waxaan u malaynayaa in Ilaah na soo saaray, annagoo ah rasuulladii ugu dambeeyey, sida kuwa dhimashada lagu xukumay oo kale, maxaa yeelay, wax la daawado ayaa lanooga dhigay dunida, iyo malaa'igaha, iyo dadkaba. **10** Annagu waxaannu nahay Masiixa aawadiis

doqonno, idinkuse caqli baad ku leedihiin xagga Masiixa.
Annagu waa xoog darannahay, idinkuse waad xoog badan
tihiin, idinku ammaan baad leedihiin, annaguse waa maamuus
la' nahay. 11 Tan iyo saacaddan waan gaajaysan nahay,
waanan harraadsan nahay, waanan arradan nahay, waa
nala garaacay, oo meel aan ku hoyannona ma lihin. 12
Waana hawshoonnaa annagoo gacmahayaga ku shaqayna;
markii lana caayona waan ducaynaa; markii lana silciyona
waan dulqaadannaa. 13 Markii lana xantona, si qabow
ayaannu u hadallaa, waxaannu noqonnay uskagga dunida
iyo waxa ugu wasakhsan wax kasta tan iyo haatan. 14
Anigu waxyaalahaas u qori maayo inaan idin ceebeeyo
laakiin inaan idin waaniyo sida carruurtayda aan jeclahay oo
kale. 15 In kastoo aad leedihiin toban kun oo Masiix idinku
rabbeeyey, aabbayaal badan ma lihidin, waayo, Ciise Masiix
ayaan idinku dhalay xagga injiilka. 16 Haddaba waxaan
idinka baryayaa inaad igu dayataan. 17 Taas aawadeed
waxaan idiin soo diray Timoteyos oo xagga Rabbiga ah
wiilkayga aan jeclahay oo aaminka ah. Wuu idin xusuusin
doonaa socodkayga ee ah xagga Masiixa, sidaan meel kasta
wax ugu baro kiniisad kasta. 18 Qaar baa kibray sidii anigoo
aan idiin imanaynin. 19 Laakiin dhowaan baan idiin iman
doonaa, haddii Rabbigu yidhaahdo, oo markaasaan garan
doonaa kuwa kibray xooggooda, ee ma aha hadalkooda. 20
Waayo, boqortooyada Ilaah hadal ma aha, ee waa xoog.
21 Maxaad doonaysaan? Ma inaan ul idiinla imaado, mise
jacayl iyo ruux qabow?

5 Meel walba waxaa laga maqlay in dhexdiinna ay sino ku
jirto, sinada caynkaas ahna xataa dadka aan Yuhuudda
ahayn ma qabaan, taasoo ah inuu midkiin naagtii aabbihii
haysto. 2 Weliba waad kibirsan tihiin, kamana aydnaan
caloolxumaan, si kii waxaas sameeyey dhexdiinna looga
saaro. 3 Waayo, runtii, in kastoo jidhkaygu idinka maqan
yahay, ruuxaygu waa idinla joogaa, oo sidii aniga oo
jooga ayaan kii waxaas sameeyey ku xukumay 4 magaca
Rabbigeenna Ciise. Markaad idinka iyo ruuxayguba isugu
timaadaan xoogga Rabbigeenna Ciise, 5 waa inaad kaasoo
kale Shayddaanka u dhiibtaan in jidhku baabba'o, ruuxuse
badbaado maalinta Rabbiga. 6 Faankiinnu ma wanaagsana.
Miyeydnaan garanaynin in in yar oo khamiir ah ay cajiinka
oo dhan khamiiriso? 7 Khamiirkii hore iska safeeya inaad
noqotaan cajiin cusub sidii idinkoo aan khamiirsanayn.
Waayo, Masiixa ah Kormariddeenna waa la sadqeeyey. 8
Haddaba yeynan ku iidin khamiirkii hore ama khamiirka
xumaanta iyo sharka, laakiin aan ku iidno kibista khamiirka
la' ee daacadda iyo runta ah. 9 Waxaan warqaddaydii
idiinku soo qoray inaydnaan kuwa sinaysta raacin. 10 Ulama
jeedo kuwa sinaysta ee dunidan, iyo kuwa damaca badan
iyo kuwa wax dulma, iyo kuwa sanamka caabuda, waayo,
hadday sidaas tahay waxay noqon lahayd inaad dunida
ka baxdaan. 11 Laakiin hadda waxaan idiin soo qoray, Ha
raacina qof walaal la yidhaahdo hadduu sinaysto, ama wax
badan damco, ama sanam caabudo, ama wax caayo, ama
sakhraamo, ama wax dulmo. Waa inaydnaan kaasoo kale
xataa wax la cunin. 12 Waayo, maxaa iigu jira inaan xukumo
kuwa dibadda ah? Idinku miyeydnaan xukumin kuwa gudaha
ku jira? 13 Kuwa dibadda ah Ilaah baa xukuma. Idinkuse kan
sharka leh dhexdiinna ka saara.

6 Midkiin haddii uu xaal ku haysto kan kale, miyuu ku dhacaa
inuu ku dacweeyo kuwa aan xaqa ahayn hortooda, oo
aanu ku dacwayn quduusiinta hortooda? 2 Mise waydnaan
garanaynin in quduusiintu ay dunida xukumi doonaan? Oo
haddaad dunida xukuntaan, ma waxaad tihiin kuwa aan
istaahilin inay waxyaalaha yaryar xukumaan? 3 Miyeydnaan
ogayn inaynu malaa'igaha xukumi doonno? Intee ka badan
baa waxyaalaha noloshan ku saabsan aynu xukumaynaa? 4
Haddaba haddii aad leedihiin axwaal ku saabsan waxyaalaha
noloshan, kuwa aan waxba ka ahayn kiniisadda miyaad ka
dhigaysaan inay xukumaan? 5 Waxaan taas u leeyahay
inaan idin ceebeeyo. Ma sidaas baa inaan dhexdiinna laga
helaynin mid xigmad leh oo karaya inuu u gar qaybiyo
walaalihiis, 6 laakiin in walaal walaalkii dacweeyo oo uu
weliba ku dacweeyo kuwa aan rumaysnayn hortooda? 7
Haddaba waa idiin wada daran tahay in midkiinba midka
kale dacweeyo. Maad iska daysaan, ha laydin xumeeyee?
Maad iska daysaan, ha laydin dulmee? 8 Laakiin idinka
qudhiinnu wax baad xumaysaan oo dulantaan, oo xataa
walaalihiin. 9 Ama miyeydnaan ogayn in kuwa xaqa darani
ayan dhaxlayn boqortooyadii Ilaah? Yaan laydin khiyaanayn.
Ama dhillayaasha, ama kuwa sanamka caabuda, ama kuwa
sinaysta, ama khaanisiinta, 10 ama tuugagga, ama kuwa wax
badan damca, ama kuwa sakhraama, ama kuwa wax caaya,
ama kuwa wax dulma, ma dhaxli doonaan boqortooyadii
Ilaah. 11 Qaarkiin sidaas oo kale baad ahaan jirteen, laakiin
waa laydinka maydhay, quduus baa laydinka dhigay, xaq
baa laydinkaga dhigay magaca Rabbi Ciise Masiix iyo Ruuxa
Ilaaheenna. 12 Wax waliba waa ii xalaal, laakiin wax waliba
iima roona. Wax waliba waa ii xalaal, laakiin waxba ima
addoonsan doonaan. 13 Cuntada waxaa loo sameeyey
caloosha, calooshana cuntada, laakiin Ilaah baa baabbi'in
doona tan iyo taaba. Jidhka looma samayn sinada ee waxaa
loo sameeyey Rabbiga, Rabbiguna jidhkuu xannaaneeyaa.

14 Ilaah waa sara kiciyey Rabbiga, innagana xooggiisa
ayuu inagu sara kicin doonaa. 15 Miyaanaydin garanaynin
jidhadhkiinnu inay yihiin xubnaha Masiixa? Haddaba miyaan
qaadaa xubnaha Masiixa oo dhillo xubnaheed ka dhigaa?
Yaanay noqon. 16 Miyaanaydin ogayn inuu kii dhillo raacaa
la jidh yahay? Waayo, Ilaah wuxuu leeyahay, Labadu waxay
noqon doonaan isku jidh. 17 Laakiin kii Rabbiga raacaa
waa la ruux. 18 Ka carara sinada. Dembi kaloo kasta oo
nin falo, jidhka waa ka dibadda, laakiin kii dhillanimada
falaa jidhkiisuu ku dembaabaa. 19 Ama miyaanaydin ogayn
jidhkiinnu inuu yahay macbudka Ruuxa Quduuska ah ee
idinku jira ee aad Ilaah ka hesheen? Oo idinku isma lihidin,
20 waayo, qiimo weyn baa laydinku soo iibsaday. Sidaa
aawadeed Ilaah jidhkiinna ku ammaana.

7 Waxyaalahaad ii soo qorteen xaggooda, Waxaa nin u
wanaagsan inuusan qof dumar ah taaban. 2 Laakiin si
aan loo sinaysan, nin kastaa afadiisa oo qudha ha haysto,
naag kastaana ninkeeda oo qudha ha haysato. 3 Ninku afada
waxa ku qumman ha siiyo, sidaas oo kale afaduna ninka
waxa ku qumman ha siiso. 4 Afadu jidhkeeda uma taliso,
laakiin ninkaa u taliya, sidaas oo kale ninku jidhkiisa uma
taliyo, laakiin afadaa u talisa. 5 Ha isdiidina, wakhti aad ku
heshiisaan inaad soon iyo tukasho u goosataan mooyaane,
oo aad haddana isu timaadaan, si aan Shayddaanku idiin
duufin iscelinla'aantiinna aawadeed. 6 Laakiin taas fasax
ahaan ayaan u leeyahay ee amrise maayo. 7 De waxaan
jeclaan lahaa in nimanka oo dhammu ay sidayda oo kale
yihiin. Laakiin nin kastaaba hadiyad gooni ah ayuu Ilaah ka
helaa, midkan sidan, kaasna sidaas. 8 Laakiin anigu waxaan
kuwa aan guursan iyo carmallada laga dhintay ku leeyahay,
Waa u roon tahay iyaga inay sidayda oo kale sii ahaadaan, 9
laakiin hadday iscelin kari waayaan, ha guursadeen; waayo,
waxaa dhaanta inay guursadaan intay guban lahaayeen. 10
Laakiin kuwa guursaday waxaan ku amrayaa, kan amrayaa
aniga ma aha laakiin waa Rabbiga, Afadu yaanay ninkeeda
ka tegin. 11 Laakiin hadday ka tagto, ha iska guur la'aato
ama ninkeedii ha la heshiiso; oo ninkuna yaanu afadiisa ka
tegin. 12 Kuwa kale anigu waxaan ku leeyahay ee ma aha
Rabbiga, Hadduu mid walaal ah qabo afo aan rumaysanayn,
oo ayna raalli ka tahay inay la joogto, yaanu ka tegin. 13
Oo afadii nin aan rumaysanayni qabo oo isna raalli ka
yahay inuu la joogo, yaanay ninkeeda ka tegin. 14 Waayo,
ninka aan rumaysanayni wuxuu quduus ku noqdaa xagga
naagta, oo naagta aan rumaysanaynina waxay quduus ku
noqotaa xagga ninka rumaysan, haddii kale carruurtiinna
wasakh bay ahaan lahaayeen, laakiin haatan waa quduus.
15 Laakiin haddii kan aan rumaysanayni tago, ha iska tago.
Waxaas oo kale walaalka ama walaashu uma xidhxidhna.
Ilaah wuxuu inoogu yeedhay nabad. 16 Waayo, sidee baad
ku garanaysaa, naag yahay, inaad ninkaaga badbaadin
doonto iyo in kale? Ama sidee baad ku garanaysaa, nin
yahow, inaad naagtaada badbaadin doonto iyo in kale?
17 Hase ahaatee, mid kastaa ha u socdo sidii Rabbigu
ugu qaybshay iyo sidii Ilaah mid kasta ugu yeedhay. Oo
sidaasaan kiniisadaha oo dhan ku amraa. 18 Nin gudan ma
loo yeedhay? Gudniinla'aan yaanu noqon. Nin aan gudnayn
ma loo yeedhay? Yaan la gudin. 19 Gudniintu waxba ma
aha; gudniinla'aantuna waxba ma aha, laakiin waxaa waajib
ah in la xajiyo qaynuunnada Ilaah. 20 Nin kastaa sidii
loogu yeedhay, ha sii ahaado. 21 Ma laguu yeedhay adigoo
addoon ah? Dan ha u gelin. Laakiin haddaad karayso inaad
xorowdid, waa inaad aqbashid. 22 Waayo, kii xagga Rabbiga
loogu yeedhay isagoo addoon ah, wuxuu yahay ninka xorta
ah ee Rabbiga, sidaas oo kalena kii isagoo xor ah loo
yeedhay, wuxuu yahay addoonka Masiix. 23 Qiimo weyn baa
laydinku soo iibsaday; addoommada dadka ha noqonina. 24
Walaalayaalow, nin kastaa sidii loogu yeedhay ha sii ahaado,
isagoo Ilaah la jira. 25 Amar bikradaha ku saabsan kama
haysto xagga Rabbiga, laakiin waxaan kula talinayaa sida
mid Rabbiga naxariis ka helay inuu aamin ahaado. 26 Sidaa
daraaddeed waxay ila tahay dhibta haatan joogta aawadeed
inay u roon tahay nin inuu sii ahaado siduu yahay. 27
Miyaad naag ku xidhan tahay? Ha doonin inaad ka furnaato.
Miyaad naag ka furan tahay? Ha doonin naag. 28 Laakiin
haddaad guursatid ma aad dembaabin, bikraduna hadday
guursato ma ay dembaabin, laakiin kuwaas oo kale xagga
jidhka dhib bay ka heli doonaan, laakiin dhibtaasaan idinka
celin lahaa. 29 Laakiin waxaan leeyahay, walaalayaalow,
wakhtiga waa la soo gaabiyey, hadda kaddib kuwa naagaha
qabaa ha ahaadeen sidii iyagoo aan qabin; 30 oo kuwa
ooyaana sidii iyagoo aan ooyin, kuwa farxaana sidii iyagoo
aan farxin, kuwa wax iibsadaana sidii iyagoo aan waxba
lahayn; 31 kuwa dunidan ku isticmaalaana, sidii iyagoo aan
aad ugu isticmaalin, waayo, xaalka dunidan waa idlaanayaa.
32 Waxaan jeclaan lahaa inaad welwel la'aataan. Kii aan
guursanin wuxuu u welwelaa waxyaalaha Rabbiga, siduu
Rabbiga uga farxin lahaa. 33 Laakiin kii guursaday wuxuu u
welwelaa waxyaalaha dunida siduu afadiisa uga farxin lahaa.
34 Afada iyo bikraddu waa kala duwan yihiin. Tii aan la qabinu
waxay u welweshaa waxyaalaha Rabbiga si ay quduus uga
ahaato xagga jidhka iyo xagga ruuxa. Tii guursatay waxay u
welweshaa waxyaalaha dunida si ay ninkeeda uga farxiso.
35 Tan waxaan idinku leeyahay waxtarkiinna aawadii ee ma
aha inaan qool idin geliyo, laakiin in waxa roon la arko iyo

inaad Rabbiga u adeegtaan kalajeedsadla'aan. 36 Nin uun
hadduu u maleeyo inuu wax aan toosnayn ku falayo xagga
bikraddiisa, hadday wakhtigii dhallinyaronimadeedii dhaafto
oo sidaas loo baahnaado, ha sameeyo wuxuu dooni lahaa.
Dembaabi maayo ee ha guursadeen. 37 Kii qalbigiisa ka
adkaysta, isagoo aan la qasbin, laakiin nafsaddiisa u taliya,
uuna qalbigiisa ka goostay inuu bikraddiisa iska sii hayo, si
wanaagsan buu falaa. 38 Sidaasna kii bikraddiisa u guuriyaa
si wanaagsan ayuu falaa, iyo kii bikraddiisa aan u guurinin
si ka wanaagsan ayuu falaa. 39 Naag waxay ku xidhan
tahay ninkeeda intuu nool yahay, laakiin haddii ninku dhinto,
waa xor inay guursato kay doonto laakiin xagga Rabbiga oo
keliya. 40 Laakiin way ka sii faraxsanaan lahayd hadday iska
joogto, siday aniga ila tahay, oo anigu waxaan u malaynayaa
inaan Ruuxa Ilaah leeyahay.

8 Xagga waxyaalaha sanamyada loo sadqeeyo, waxaynu
garanaynaa inaynu dhammaan aqoon u wada leennahay.
Aqoontu way kibrisaa, jacaylkuse wax buu dhisaa. 2 Qof
uuni hadduu u malaynayo inuu wax garanayo, weli garan
maayo siduu u garan lahaa. 3 Laakiin qof uuni hadduu Ilaah
jecel yahay, Ilaah baa garanaya isaga. 4 Haddaba xagga
cunidda waxyaalaha sanamyada loo sadqeeyo, waxaynu
garanaynaa inuusan sanam waxba dunida ka ahayn oo aan
Ilaah jirin mid mooyaane. 5 Waayo, in kastoo ay samada iyo
dhulkaba jiraan wax ilaahyo lagu sheego, sidii iyadoo ilaahyo
badan iyo sayidyo badni jiraan, 6 laakiin innagu waxaynu
leennahay Ilaah keliya oo Aabbaha ah, kan wax waluba ka
yimaadaan oo innagana isagaa ina leh, iyo Sayid keliya oo
Ciise Masiix ah, kan wax waluba ku ahaadeen oo innaguna
isagaynu ku ahaannay. 7 Laakiin dad oo dhammu aqoontaas
ma wada laha, laakiin qaar sanamka tan iyo hadda u
bartay, waxay u qabaan waxay cunaan sidii wax sanam loo
sadqeeyo, qalbigooda itaalka daranina wuu nijaasoobay.
8 Cuntadu ina hor joojin mayso Ilaah. Haddaynan cunin
waxba inagama dhacaan, haddaynu cunnona waxba inooma
kordhaan. 9 Laakiin iska dhawra si aan ikhtiyaarkiinnu wax
lagu turunturoodo ugu noqon kuwa itaalka daran. 10 Haddii
qof ku arko adigoo aqoonta leh oo cunto ugu fadhiya meeshii
sanamyada, hadduu qalbiga ka itaal daranyahay, qalbigiisu
miyaanu ku adkaanaynin inuu cuno waxa sanamyada loo
sadqeeyo? 11 Waayo, waxaa aqoontaada aawadeed lumaya
ka itaalka daran oo ah walaalkaagii uu Masiixu aawadiis u
dhintay. 12 Markaad walaalaha sidaas ugu dembaabtaan
oo aad qalbigooda itaalka daran u xumaysaan, waxaad
ku dembaabtaan Masiix. 13 Taa aawadeed haddii cunto
walaalkay xumayso, hilib weligay ma cuni doono si aanan
walaalkay u xumayn. **(aiōn g165)**

9 Miyaanan xor ahayn? Miyaanan rasuul ahayn? Miyaanan
arkin Rabbigeenna Ciise? Miyeydnaan ahayn shuqulkayga
xagga Rabbiga? 2 Xataa haddaanan kuwa kale rasuul u
ahayn, idinka waa idiin ahay, waayo, waxaad tihiin shaabadda
rasuulnimadayda xagga Rabbiga. 3 Daafacaaddayda aan
kuwa i imtixaama iskaga daafaco waa tan. 4 Miyaannan
annagu jid u lahayn inaannu wax cunno oo wax cabno?
5 Miyaannan jid u lahayn inaannu haweenay walaal ah
kaxaysanno sida rasuullada kale iyo walaalaha Rabbiga
iyo Keeyfas ay sameeyaan? 6 Mise aniga iyo Barnabas oo
keliyaan jid u lahayn inaannan shaqayn? 7 Askarigee baa
qarashkiisa weligiis iska bixiya? Yaa beer canab ah beera
oo aan midhaheeda cunin? Ama yaa adhi daajiya oo aan
caanaha adhiga dhamin? 8 Waxyaalahaas ma sida dad baan
u leeyahay? Oo sharcigu miyuusan waxyaalahaas oo kale
lahayn? 9 Waayo, waxaa ku qoran sharciga Muuse, Waa
inaadan dibiga af xidhin markuu sarreenka burburinayo. Ma
Ilaah baa dibiyada oo keliya dhawra, 10 mise innagoo dhan
buu inoola jeeda? Hubaal, aawadeen baa loo qoray, waayo,
kan beerta qodaa waa inuu rajo ku qodo, kan tumaana
waa inuu tumo isagoo rajaynaya inuu wax qayb u helo. 11
Haddaannu idinku beernay waxyaalaha ruuxa, ma wax weyn
baa haddaannu waxyaalaha jidhka idinka urursaano? 12
Qaar kale hadday waxaas jid idiinku leeyihiin, miyaannan
annagu si ka badan idiinku lahayn? Hase ahaatee, waxan
noo jidka ah kuma aannu isticmaalin, laakiin wax walba
waannu u dulqaadannaa inaannan sina u joojin injiilka
Masiix. 13 Miyeydnaan ogayn kuwa waxyaalaha quduuska
ah ka shaqeeyaa inay macbudka wax ka cunaan, kuwa
meesha allabariga ka adeegaana inay meesha allabariga
qayb ku leeyihiin? 14 Sidaas oo kale Rabbigu wuxuu amray
in kuwa dadka injiilka ku wacdiyaa ay injiilka ku noolaadaan.
15 Laakiin waxyaalahaas midkoodna kuma aan isticmaalin.
Haddana waxyaalahan u qori maayo in sidaas la ii yeelo,
waayo, waxaa ii roon inaan dhinto intii nin uun faankayga ka
dhigi lahaa wax aan wax ka jirin. 16 Waayo, haddaan dadka
injiilka ku wacdiyo, wax aan ku faano ma aha, waayo, wax
baa i qasbaya, maxaa yeelay, waa ii hoog haddaanan dadka
injiilka ku wacdiyin. 17 Waayo, haddaan waxaas ku sameeyo
doonistayda aawadeed, abaalgud baan helayaa, laakiin
haddaanan doonistayda ku samayn, weli wakiilnimo baa
laygu aaminay. 18 Haddaba abaalgudkaygu waa maxay?
Waa in markaan injiilka dadka ku wacdiyo aan injiilka ka
dhigo iibla'aan, si aanan ugu wada isticmaalin waxa ii jidka

ah xagga injiilka. 19 Waayo, in kastoo aan xor ka ahaa dad
oo dhan, dhammaan ayaan addoon isaga dhigay, si aan
qaar kaloo badan u soo kordhiyo. 20 Yuhuudda waxaan u
noqday sida Yuhuudi oo kale, si aan Yuhuud kale u soo
kordhiyo. Kuwa sharciga ka hooseeyana, sida mid sharciga
ka hooseeya ayaan u noqday, aniga oo aan sharciga ka
hoosayn, si aan kuwa sharciga ka hooseeya u soo kordhiyo.
21 Xagga kuwa aan sharciga lahayn, sida mid aan sharci
lahayn ayaan u noqday anigoo aan ahayn mid sharci la'
xagga Ilaah, laakiin sharci leh xagga Masiix, si aan u soo
kordhiyo kuwa aan sharciga lahayn. 22 Xagga kuwa itaalka
daran waxaan u noqday mid itaaldaran, si aan kuwa itaalka
daran u soo kordhiyo. Dadka oo dhan ayaan wax kasta
u noqday inaan si kastaba qaar ku badbaadiyo. 23 Wax
kasta waxaan u sameeyaa injiilka aawadiis, si aan u noqdo
mid injiilka la qaybsada iyaga. 24 Miyaanad ogayn in kuwa
tartan ku ordaa ay wada ordaan, laakiin mid uun baa dheefta
hela? Sidaas u orda inaad heshaan. 25 Kii cayaarta aad ugu
dadaalaa, wax walba ayuu iska dhawraa. Kuwaasu haddaba
waxay sidaas u yeelaan inay taaj dhammaanaya helaan,
innaguse waxaynu helaynaa mid aan dhammaanaynin. 26
Haddaba anigu uma ordo qasdila'aan, uma feedhtamo sida
mid dabaysha ku dhufanaya. 27 Laakiin jidhkaygaan dhibaa
oo addoon ka dhigaa si markaan qaar kale injiilka ku wacdiyo
aan qudhayda lay diidin.

**10** Walaalayaalow, anigu dooni maayo inaad garan
weydaan siday awowayaasheen oo dhammu daruurta
uga wada hooseeyeen, oo ay dhammaantood badda u
wada dhex mareen, 2 iyo sidii dhammaantood xaggii
Muuse loogu baabtiisay daruurta iyo baddaba, 3 iyo siday
dhammaantood u wada cuneen isku cunto ruuxa ah, 4 oo
dhammaantoodna ay u wada cabbeen isku cabbid ruuxa ah,
waayo, waxay ka cabbeen dhagaxa ruuxa ah oo ka daba
imanayay iyaga, dhagaxuna wuxuu ahaa Masiixa. 5 Laakiin
Ilaah kuma farxin badidood, oo waxaa iyaga lagu rogay
cidlada. 6 Waxyaalahaasi waxay inoo noqdeen masaallo
si aynaan waxyaalaha sharka ah u damcin siday iyagu
u damceen. 7 Oo kuwa sanamka caabuda ha ahaanina
siday qaarkood u ahaayeen. Sida qoran, Dadku waxay u
fadhiisteen inay wax cunaan oo wax cabbaan, oo waxay
u kaceen inay cayaaraan. 8 Oo yeynan sinaysanin siday
qaarkood u sinaysteen oo saddex iyo labaatan kun ay
maalin keliya u dhinteen. 9 Oo yeynan jirrabin Rabbiga siday
qaarkood u jirrabeen oo ay masasku u baabbi'iyeen. 10
Oo ha gunuunacina siday qaarkood u gunuunaceen oo uu
baabbi'iyuhu u baabbi'iyey. 11 Waxyaalahaasi waxay iyaga
ugu dhaceen masaal ahaan, oo waxaa loo qoray in laynagu
waaniyo innagoo wakhtiyada dhammaatinkoodii ina soo
gaadhay. (aiōn g165) 12 Sidaa daraaddeed kii u malaynaya inuu
taagan yahay, ha iska eego inuusan dhicin. 13 Jirrabaadna
idinma qabsan tan dadka wada qabsata mooyaane, laakiin
Ilaah waa aamin, mana oggolaan doono in laydin jirrabo
intaad karaysaan in ka badan, laakiin markii laydin jirrabo
wuxuu samayn doonaa jid aad kaga baxsataan si aad ugu
adkaysan kartaan. 14 Sidaa daraaddeed, gacaliyayaalow,
sanamcaabudidda ka carara. 15 Waxaan idiinla hadlayaa
sida dad caqli leh loola hadlo oo kale. Idinku qiyaasa waxaan
leeyahay. 16 Koobka barakada leh ee aynu u ducayno
miyaanu ahayn islawadaagidda dhiigga Masiix? Kibistaynu
jebinnaa, miyaanay ahayn islawadaagidda jidhka Masiix?
17 Innagu in kastoo aynu badan nahay, waxaynu nahay
jidh qudha, maxaa yeelay, waxaa jira kibis qudha, waayo,
dhammaanteen waxaynu wada qaybsannaa kibista qudha. 18
Eega reer binu Israa'iil xagga jidhka; kuwa allabaryada cunaa
miyaanay la wadaagin meesha allabariga? 19 Haddaba
maxaan leeyahay? Wax sanam loo sadqeeyo waa wax?
Ama, sanam baa wax ah? 20 Laakiin waxyaalaha ay dadka
aan Yuhuudda ahayn sadqeeyaan, waxay u sadqeeyaan
jinniyo, ee Ilaah uma sadqeeyaan. Dooni maayo inaad
jinniyada wax la wadaagtaan. 21 Iskuma wada cabbi kartaan
koobka Rabbiga iyo koobka jinniyada. Kama wada qayb geli
kartaan miiska Rabbiga iyo miiska jinniyada. 22 Miyaynu
Rabbiga ka hinaasinnaa? Miyaynu isaga ka xoog badan
nahay? 23 Wax waliba waa xalaal, laakiin wax waliba ma
roona. Wax waliba waa xalaal, laakiin wax waliba wax ma
dhisaan. 24 Ninna yuusan doonin waxa isaga qudhiisa u
roon, laakiin mid kasta ha doono waxa kan kale u roon. 25
Wax kasta oo suuqa lagu iibiyo cuna, idinkoo aan waxba
weyddiinaynin niyada aawadeed. 26 Waayo, Rabbigaa leh
dhulka iyo waxa ku jira oo dhanba. 27 Mid ka mid ah kuwa
aan rumaysnayn hadduu diyaafad idiinku yeedho oo aad
doonaysaan inaad tagtaan, wax kasto oo laydin hor dhigoba
cuna, idinkoo aan waxba weyddiinaynin niyada aawadeed.
28 Laakiin haddii laydinku yidhaahdo, Tanu waa wax sanam
loo sadqeeyey, ha cunina, kan idiin sheegay aawadiis iyo
niyada aawadeed. 29 Waxaan leeyahay, niyada kan kale, ee
ma aha taada. Waayo, xoriyaddayda maxaa loogu xukumaa
mid kale niyadiis? 30 Haddaan mahad kaga qayb galo,
maxaa la iigu caayaa wixii aan ku mahadnaqo? 31 Haddaba
haddaad wax cuntaan, ama wax cabtaan, ama wax kastaad
samaysaan, dhammaan u wada sameeya Ilaah ammaantiisa.
32 Wax lagu turunturoodo ha u noqonina Yuhuudda ama
Gariigta ama kiniisadda Ilaah, 33 sidaan aniguba dadka oo

dhan uga farxiyo wax kastaba, anigoo aan doonaynin waxa ii
roon, laakiin waxa kuwa badan u roon, si ay u badbaadaan.

**11** Igu dayda sidaan aniguba Masiix ugu daydo. **2** Waxaan
idinku ammaanayaa inaad wax walba igu xusuusataan
oo aad u xagsataan cilmiga sidaan idiinku sheegay. **3** Laakiin
waxaan jeclaan lahaa inaad ogaataan inuu Masiixu yahay
madaxa nin kasta, ninkuna inuu yahay madaxa naagta,
Ilaahna inuu yahay madaxa Masiixa. **4** Nin kasta oo tukada
ama wax sii sheega isagoo madaxa wax u saaran yihiin,
madaxiisuu ceebeeyaa. **5** Oo naag kasta oo tukata ama
wax sii sheegta iyadoo aan gambaysnayn, madaxeeday
ceebaysaa. Waayo, waxay la mid tahay sidii iyadoo madax
xiiran. **6** Naag haddaanay gambaysnayn, timaha ha loo
jaro, laakiin hadday ceeb ku tahay naag in loo jaro ama
in loo xiiro, ha gambaysato. **7** Nin waa inuusan madaxa
dedan, waayo, ninku wuxuu yahay u-ekaanta iyo ammaanta
Ilaah; naagtuna waxay tahay ammaanta ninka. **8** Waayo,
ninku xagga naagta kama uu iman, laakiin naagtuse xagga
ninka ayay ka timid. **9** Maxaa yeelay, ninka looma abuurin
naagta aawadeed, laakiin naagtase ninka aawadiis ayaa
loo abuuray. **10** Taas aawadeed naagtu waxay leedahay
inay madaxeeda ku lahaato astaanta amarka, malaa'igaha
aawadood. **11** Hase ahaatee, xagga Rabbiga naagtu waxba
ma aha ninka la'aantiis, ninkuna waxba ma aha naagta
la'aanteed. **12** Waayo, sida naagtu ninka uga timid ayaa
ninkuna naagta uga dhashay, wax kastana xagga Ilaah bay
ka yimaadeen. **13** Idinkuba ka fiirsada. Ma u eg tahay naagta
inay Ilaah barido iyadoo aan gambaysnayn? **14** Dabiicadda
qudheedu miyaanay idin barin in ninku hadduu timo dheer
leeyahay ay maamuusdarro u yihiin isaga, **15** laakiin naagtu
hadday timo dheer leedahay, waa u sharaf iyada. Waayo,
timaha waxaa iyada loo siiyey hagoog. **16** Laakiin haddii nin
u eg yahay mid ilaaq jecel, caadadaas oo kale annagu ma
lihin, kiniisadaha Ilaahna ma laha. **17** Anigoo tan idin faraya,
idin ammaani maayo, waayo, isuguma timaadaan waxa roon,
ee waxaad isugu timaadaan waxa daran. **18** Horta haddaba
waxaan maqlay inaad iskala qaybisaan markaad kiniisadda
isugu timaadaan, badhna waan rumaysanahay. **19** Waayo,
dhexdiinna waa inay jiraan waxyaalo idinkala sooco in kuwa
loo bogay ay idinka dhex muuqdaan. **20** Sidaa daraaddeed
markaad isu timaadaan, isuguma timaadaan inaad cashada
Rabbiga cuntaan. **21** Waayo, mid kasta cashadiisuu kan
kale ka hor cunaa, mid waa gaajaysan yahay, midna waa
sakhraansan yahay. **22** Sow ma lihidin guryo aad wax
ku cuntaan oo wax ku cabtaan? Mise kiniisadda Ilaah
baad fududaysanaysaan, oo aad kuwa aan waxba haysan
ceebaynaysaan? Maxaan idinku idhaahdaa? Ma waxanaan
idinku ammaanaa? Idinku ammaani maayo! **23** Waayo,
Rabbigaan ka helay wixii aan idiin dhiibay, taasoo ah, in
Rabbi Ciise habeenkii la gacangeliyey uu kibis qaaday, **24**
oo markuu ku mahadnaqay ayuu jejebiyey oo yidhi, Tanu
waa jidhkaygii laydiin jejebiyey, tan u sameeya inaad igu
xusuusataan. **25** Sidaas oo kalena cashada dabadeed ayuu
qaaday koobkii, isagoo leh, Koobkanu waa axdiga cusub
ee dhiiggayga. Tan u sameeya inaad igu xusuusataan mar
alla markaad cabtaan. **26** Waayo, mar alla markaad kibistan
cuntaan oo aad koobkan cabtaan, waxaad muujinaysaan
dhimashada Rabbiga ilaa uu yimaado. **27** Taas aawadeed
ku alla kii kibista u cuna ama koobka Rabbiga u cabba si
aan istaahilin, jidhka iyo dhiigga Rabbigu dushiisay noqon
doonaan. **28** Nin kastaa ha is-imtixaamo, oo sidaas kibista
wax ha uga cuno, oo koobka ha uga cabbo. **29** Waayo, kii
cuna oo cabba, xukun ayuu naftiisa u cunaa oo u cabbaa
isagoo aan jidhka garanaynin. **30** Sababtaas aawadeed ayay
badidiinnu u itaal daranyihiin, oo u bukaan, oo qaar aan
yaraynu u dhinteen. **31** Laakiin haddaynu innagu dhexdeenna
iska xukumi lahayn, laynama xukumeen. **32** Markii layna
xukumo, Rabbiga ayaa ina edbiya, inaan laynala xukumin
dunida. **33** Taa aawadeed, walaalahayow, markaad isugu
timaadaan inaad wax cuntaan, isa suga. **34** Nin uun hadduu
gaajoodo, gurigiisa wax ha ka soo cuno, inaydnaan xukun
isugu iman. Intii kale waxaan hagaajin doonaa markaan
imaado.

**12** Walaalayaalow, dooni maayo inaad jaahil ka ahaataan
waxa ku saabsan hadiyadaha Ruuxa ka yimaada. **2**
Waad og tihiin in, markaad dad aan Ilaah aaminin ahaan
jirteen, laydin geeyn jiray sanamyada aan hadli karin, si
laydinku geeyn jirayba. **3** Sidaa daraaddeed waxaan idin
ogeysiinayaa inaan nin Ruuxa Ilaah ku hadlaa odhanaynin,
Ciise waa inkaaran yahay, oo aan ninna odhan karin, Ciise
waa Rabbi, inuu Ruuxa Quduuska ah ku hadlo mooyaane. **4**
Waxaa jira hadiyado kala cayn ah, laakiin waa isku Ruux.
**5** Waxaana jira adeegid kala cayn ah, waana isku Rabbi.
**6** Waxaana jira shuqullo kala cayn ah, laakiin waa isku
Ilaah, kan dhammaan wax walba kaga dhex shaqeeya. **7**
Laakiin mid kasta waxaa muujinta Ruuxa loo siiyaa waxtar.
**8** Mid waxaa laga siiyaa xagga Ruuxa hadal xigmad ah,
mid kalena hadal aqoon ah siduu isku Ruuxu doonayo. **9**
Mid kale Ruuxu rumaysad buu siiyaa, mid kalena hadiyado
wax lagu bogsiiyo ayuu isku Ruuxu siiya. **10** Mid kalena
shuqullo cajaa'ib leh, mid kalena wax sii sheegidda, mid
kalena kalasoocidda ruuxyada, mid kalena afaf kala cayn ah,

mid kalena afafka fasiriddooda. 11 Isku Ruuxa oo keliya ayaa
ka shaqeeya waxyaalahaas oo dhan, isagoo siduu doonayo
mid mid wax ugu qaybinaya. 12 Haddaba sida jidhku mid
keliya u yahay, oo uu xubno badan u leeyahay, oo xubnaha
oo dhan ee jidhka ay jidh keliya u yihiin, in kastoo ay badan
yihiin, Masiixuna waa sidaas oo kale. 13 Waayo, Ruux qudha
ayaa dhammaanteen jidh qudha inagu baabtiisay, haddaynu
nahay Yuhuud ama Gariig, ama addoommo ama kuwa xor
ah, oo waxaa laynaga waraabiyey Ruux qudha. 14 Waayo,
jidhku xubin qudha ma aha ee waa xubno badan. 15 Hadday
cagtu tidhaahdo, Anigu gacan ma ihi, taas aawadeed jidhka
ka mid ma ihi, taasu sabab u noqon mayso inaanay jidhka
ka mid ahayn. 16 Hadday dhegtu tidhaahdo, Anigu isha ma
ihi, taas aawadeed jidhka ka mid ma ihi, taasu sabab u
noqon mayso inaanay jidhka ka mid ahayn. 17 Haddii jidhka
oo dhammu il wada ahaan lahaa, meeye dhegihii wax lagu
maqli lahaana? Hadduu dhammaan dhego wada ahaan
lahaa, meeh sankii wax lagu urin lahaana? 18 Haatanse
Ilaah baa siduu doonayay xubnaha middood kastaba jidhka
ugu hagaajiyey. 19 Hadday dhammaan ahaan lahaayeen
xubin qudha, meeh jidhkii? 20 Haatanse waa xubno badan
laakiin waa jidh qudha. 21 Ishu gacanta kuma odhan karto,
Kuuma baahni; madaxuna cagaha kuma odhan karo, Idiinma
baahni. 22 Xataa xubnaha jidhka oo loo maleeyo inay u
itaal yar yihiin, iyaga qudhooda waa loo baahan yahay,
23 oo kuwa jidhka oo aynu u malayno inay u maamuus
yar yihiin, kuwaas ayaynu ka sii maamuusnaa kuwa kale,
oo xubnaheenna cawrada ah baa ka xurmo badan kuwa
kale. 24 Xubnaheenna aan cawrada ahaynse waxba uma
baahna. Laakiin Ilaah baa jidhka isku hagaajiyey isagoo
tan ugu daran maamuus badan siinaya, 25 inaan jidhku
qaybsanaan, laakiin in xubiniba xubinta kale u welwesho.
26 Haddii xubin qudha xanuunsato, xubnaha oo dhammu
way la xanuunsadaan. Haddii xubin la maamuuso, xubnaha
oo dhammu way la farxaan. 27 Idinku waxaad tihiin jidhka
Masiix iyo xubno ka mid ah. 28 Ilaah markii hore kiniisadda
qaar wuxuu uga dhigay rasuullo, markii labaadna qaar
kale nebiyo, markii saddexaadna qaar kale macallimiin,
dabadeedna qaar cajaa'ibyo sameeya, qaarna kuwo leh
hadiyado wax lagu bogsiiyo, qaarna kaalmeeyayaal, qaarna
taliyayaal, iyo qaar afaf kala cayn ah ku hadla. 29 Dhammaan
ma wada rasuullo baa? Dhammaan ma wada nebiyo baa?
Dhammaan ma wada macallimiin baa? Dhammaan ma
wada cajaa'ibyo sameeyayaal baa? 30 Dhammaan ma wada
leeyihiin hadiyado wax lagu bogsiiyo? Dhammaan ma ku
hadlaan afaf kala cayn ah? Dhammaan wax ma fasiraan? 31
Laakiin aad u doona hadiyadaha u waaweyn. Oo weliba
waxaan idin tusayaa jid kan ka sii wanaagsan.

**13** Haddaan ku hadlo afafka dadka iyo malaa'igaha,
laakiinse aanan jacayl lahayn, waxaan noqday naxaas
dhawaaqaysa ama saxan bir ah oo sanqadhaya oo kale. 2
Oo haddaan leeyahay hadiyadda wax sii sheegidda, oo aan
garanayo waxyaalaha qarsoon oo dhan iyo aqoonta oo dhan,
iyo haddaan leeyahay rumaysadka oo dhan oo aan buuraha
ku dhaqaajiyo, laakiinse aanan jacayl lahayn, waxba ma ihi.
3 Oo wax kastaan leeyahay haddaan bixiyo oo masaakiinta
ku quudiyo, iyo haddaan jidhkayga bixiyo in la gubo, laakiinse
aanan jacayl lahayn, waxba ii tari maayo. 4 Jacaylku waa
samir badan yahay, waana raxiim, jacaylku ninna ma xasdo,
jacaylku ma faano, mana kibro, 5 wax aan u ekayn ma
falo, nafsaddiisana wax uma doondoono, mana xanaaqo,
sharna kuma fikiro, 6 xaqdarrada kuma farxo, laakiin wuxuu
ku farxaa runta. 7 Wax walba wuu u dulqaataa, wax walba
wuu rumaystaa, wax walba wuu rajeeyaa, wax walba wuu u
adkaystaa. 8 Jacaylku weligii ma idlaado. Hadday wax sii
sheegiddii jirto, way baabbi'i doontaa, hadday afaf jiraan
way dhammaan doonaan, hadday aqooni jirto way baabbi'i
doontaa. 9 Waayo, waxaynu naqaan waa qabyo, oo si qabyo
ahaan ah ayaynu wax u sii sheegnaa. 10 Laakiin markii
waxa dhammi ay yimaadaan, waxa qabyada ahi way idlaan
doonaan. 11 Markaan ilmo yar ahaan jiray, sidii ilmo oo kale
ayaan u hadli jiray, sidii ilmo oo kale ayaan wax u garan
jiray, sidii ilmo oo kale ayaan u fikiri jiray, laakiinse haatan
waxaan noqday nin weyn, oo waxyaalihii carruurnimada
waan iska fogeeyey. 12 Haatan si aan caddaan ahayn
ayaynu muraayad wax ugu aragnaa, laakiin markaas ka
fool ka fool ayaynu wax u arki doonnaa. Hadda si qabyo
ahaan ah ayaan wax u garanayaa, laakiin markaas waxaan
u garan doonaa sidii la ii gartay. 13 Haddabase waxa waaraa
waa saddexdan, rumaysad iyo rajo iyo jacayl; laakiin kuwan
waxaa ugu wada weyn jacayl.

**14** Jacaylka raaca, oo weliba hadiyadaha Ruuxa ka
yimaada aad u doona, oo siiba doona inaad wax sii
sheegtaan. 2 Waayo, kii af uusan aqoon ku hadlaa, lama
hadlo dadka, wuxuuse la hadlaa Ilaah, waayo, ninna ma
garto; laakiin Ruuxa ayaa waxyaalaha qarsoon kaga dhex
hadliya. 3 Laakiin kii wax sii sheegaa wuxuu dadka kula
hadlaa hadallo wax dhisa oo gargaar iyo qalbiqaboojis
leh. 4 Kii af uusan aqoon ku hadlaa wuu isdhisaa, laakiin
kii wax sii sheegaa wuxuu dhisaa kiniisadda. 5 Waxaan
jeclaan lahaa inaad dhammaantiin afaf ku wada hadashaan,
laakiin waxaan ka sii jeclaan lahaa inaad wax sii sheegtaan.

Kii afaf ku hadlaa hadduusan fasirin, waxaa ka sii weyn
kii wax sii sheega, si ay kiniisaddu u hesho wax ay ku
dhisanto. 6 Laakiin hadda, walaalayaalow, haddaan idiin
imaado, anigoo afaf ku hadlaya, maxaan idiin tari doonaa,
haddaanan idinkula hadlin muujin ama aqoon ama wax
sii sheegid ama waxbarid? 7 Xataa waxyaalo aan naf
lahayni markay dhawaaqaan, ha ahaadeen ama biibiile ama
kataarad, haddaanay dhawaaqa kala soocin, sidee baa loo
kala garanayaa waxa la yeedhiyo ama waxa kataaradda
laga dhawaajiyo? 8 Hadduu buunku ku dhawaaqo cod aan la
kala garan, yaa dagaal isu diyaargarayn doona? 9 Sidaasoo
kalena idinku markaad af ku hadashaan haddaydnan ku
hadlin hadal la garto, sidee baa loo garanayaa waxa lagu
hadlayo? Waayo, dabayshaad la hadlaysaan. 10 Mindhaa
waxaa dunida jira codad badan oo kala cayn ah, oo mid aan
micne lahayni ma jiro. 11 Haddaba haddaanan garanaynin
micnaha codka, waxaan kii hadlaya u ahaan doonaa nin
qalaad, kan hadlayaana nin qalaad ayuu ii ahaan doonaa.
12 Sidaasoo kale idinkuna, idinkoo ku kulul hadiyadaha
ruuxa, aad u dadaala inaad hadiyado badan u lahaataan
kiniisadda dhisniinteeda. 13 Sidaa daraaddeed kii af ku
hadlaa, Ilaah ha ka baryo si uu u fasiro. 14 Waayo, haddaan
Ilaah af aanan oqoon ku baryo, ruuxayga ayaa barya, laakiin
garashadaydu faa'iido ma leh. 15 Maxaa jira haddaba?
Ruuxa ayaan Ilaah ku baryi doonaa, laakiin waxaan kaloo
isaga ku baryi doonaa garashada. Ruuxa ayaan ku heesi
doonaa, oo garashadana waan ku heesi doonaa. 16 Haddii
kale haddaad ruuxa ku ducaysid, kii meesha jooga oo aan
garanaynin, sidee buu u odhan doonaa, Aamiin, markaad
mahadnaqaysid, hadduusan garanaynin waxaad leedahay?
17 Si wanaagsan baad u mahadnaqdaa, laakiin kan kale ma
dhisna. 18 Waxaan Ilaah ugu mahadnaqayaa inaan afaf ku
hadlo intaad dhammaantiin ku hadashaan in ka badan, 19
laakiin kiniisadda dhexdeeda, meeshii aan toban kun oo
eray af kaga hadli lahaa, waxaan ka jeclaan lahaa inaan
shan eray garashadayda ku hadlo inaan kuwa kalena wax
baro. 20 Walaalayaalow, carruur ha ka noqonina xagga
maanka, xagga xumaantase dhallaan ka ahaada, laakiin
xagga maanka dad waaweyn ka ahaada. 21 Waxaa sharciga
ku qoran, Waxaan dadkan kula hadli doonaa afaf qalaad
iyo bushimo dad kale, oo xataa sidaa daraaddeed ima
maqli doonaan, ayuu Rabbigu leeyahay. 22 Haddaba afafku
calaamo uma aha kuwa rumaysta ee waxay calaamo u
yihiin kuwa aan rumaysan, wax sii sheegidduse calaamo
uma aha kuwa aan rumaysan, laakiin waxay calaamo u
tahay kuwa rumaysta. 23 Haddaba haddii kiniisadda oo
dhammu isu timaado, oo ay ku wada hadlaan afaf, oo
haddii dad aan garanaynin ama aan rumaysanayni soo
galaan, miyaanay odhanaynin, Waad waalan tihiin? 24
Laakiin hadday dhammaantood wax sii sheegaan oo uu
u yimaado mid aan rumaysanayn ama aan garanaynini,
isaga waa la wada canaantaa, oo la wada xukumaa. 25
Waxyaalaha qarsoon ee qalbigiisa waa la muujiyaa, oo
taa aawadeed wejigiisuu u dhici doonaa oo Ilaah ayuu
caabudi doonaa isagoo odhanaya, Runtii Ilaah waa idin dhex
joogaa. 26 Maxaa jira haddaba, walaalayaalow? Markaad isu
timaadaan, mid kasta hees sabuur ah buu leeyahay, midna
waxbarid buu leeyahay, midna muujin buu leeyahay, midna
af buu leeyahay, midna fasiraad buu leeyahay. Wax walba
ha loo sameeyo dhisniin. 27 Haddii nin uun af ku hadlo, ha
ahaadeen laba, ama hadday u bataan, saddex, oo midba
markiisa ha hadlo, midna ha fasiro, 28 laakiin haddaan mid
fasiraa jirin, kiniisadda ha ka aamusnaado, oo isagu ha la
hadlo qudhiisa iyo Ilaah. 29 Nebiyadana laba ama saddex
ha hadleen, kuwa kalena ha kala xukumeen waxay leeyihiin.
30 Laakiin haddii wax loo muujiyo mid ag fadhiya, kii hore ha
aamuso. 31 Waayo, dhammaantiin mid mid baad wax u sii
wada sheegi kartaan, si ay dhammaan wax u bartaan oo
dhammaan loogu wada gargaaro. 32 Oo ruuxyada nebiyadu
waa ka dambeeyaan nebiyada. 33 Waayo, Ilaah ma aha
Ilaaha iskuqasnaanta, laakiin waa kan nabadda. Kiniisadaha
quduusiinta oo dhan dhexdoodana waa sidaas oo kale. 34
Dumarku markay kiniisadaha joogaan ha aamuseen, waayo,
looma fasixin inay hadlaan; laakiin ha dambeeyeen, sida uu
sharcigu leeyahay. 35 Hadday doonayaan inay wax bartaan,
nimankooda ha ku weyddiiyeen guriga, maxaa yeelay, waa
ku ceeb naag inay kiniisadda dhexdeeda ku hadasho. 36
Maxaa jira! Ma idinkay ahaayeen kuwii uu ereyga Ilaah ka
soo baxay, mise keligiin buu idiin yimid? 37 Nin uun hadduu
isu maleeyo inuu nebi yahay, ama mid Ruuxa raaca, ha
garto waxyaalahaan idiin soo qorayo inay yihiin qaynuunka
Rabbiga. 38 Nin uuni hadduusan ogayn tan, isagana lama
yaqaan. 39 Taa aawadeed, walaalahayow, ku dadaala inaad
wax sii sheegtaan, hana diidina in afaf lagu hadlo, 40 laakiin
wax walba ha loo sameeyo si habboon oo hagaagsan.

15 Walaalayaalow, waxaan idin ogeysiinayaa injiilka aan
idinku wacdiyey, oo aad idinkuna aqbasheen, oo aad ku
taagan tihiin, 2 oo aadna ku badbaaddeen, haddaad xajisaan
hadalkii aan idinku wacdiyey, haddaydnan micnela'aan u
rumaysan. 3 Waayo, markii ugu horraysay waxaan idiin
dhiibay waxaan aniguba helay, oo waxa weeye, Masiixu
wuxuu u dhintay dembiyadeenna sida Qorniinku leeyahay, 4
waa la aasay isaga, oo maalintii saddexaad ayaa la sara

kiciyey, sida Qorniinku leeyahay. **5** Markaasuu Keeyfas u
muuqday, markii dambena laba iyo tobankii. **6** Markaasuu
wuxuu mar keliya u muuqday kuwo ka badan shan boqol oo
walaalo ah, kuwo weli intoodii badnayd ay hadda joogto,
laakiin qaar baa dhintay. **7** Gortaasuu Yacquub u muuqday,
markaas rasuullada oo dhan. **8** Markii ugu dambaysayna
aniga oo dhicis oo kale ah, ayuu ii muuqday. **9** Waayo,
anigu waxaan ahay kan rasuullada u liita oo aan istaahilin in
loogu yeedho rasuul, waayo, kiniisadda Ilaah baan silcin
jiray. **10** Laakiin Ilaah nimcadiisa ayaan ku ahay waxaan
ahayba, oo nimcadiisii lay siiyeyna wax aan waxtar lahayn
ma ay noqon, laakiin anigu waxaan u hawshooday si ka
badan dhammaantood, anigase ma aha laakiin waa nimcada
Ilaah ee ila jirtay. **11** Haddaba ha ahaato aniga ama iyaga,
sidaasaannu u wacdinnaa oo idinna u rumaysateen. **12**
Haddii dadka lagu wacdiyey in Masiixa kuwii dhintay laga
sara kiciyey, sidee baa qaarkiin u yidhaahdaa, Sarakicidda
kuwii dhintay ma jirto? **13** Haddaanay jirin sarakicidda
kuwii dhintay, Masiixana lama sara kicin. **14** Oo haddaan
Masiixa la sara kicin, markaas wacdigayagu waa khasaare,
rumaysadkiinnuna waa khasaare. **15** Waxaa la arkayaa
inaannu markhaatiyaal been ah ka nahay xagga Ilaah,
waayo, waxaannu u marag furnay inuu Masiixa sara kiciyey,
kan aanu sara kicin haddii aan kuwii dhintay la sara kicin. **16**
Haddii aan kuwii dhintay la sara kicin, Masiixana lama sara
kicin. **17** Oo haddii aan Masiixa la sara kicin, rumaysadkiinnu
waa khasaare, oo weli dembiyadiinna ayaad ku jirtaan.
**18** Oo weliba kuwii Masiixa rumaysnaa oo dhintayna, way
halligmeen. **19** Haddaynu noloshan oo keliya Masiix ku
rajayn lahayn, waxaynu ahaan lahayn kuwa u liita dadka
loo naxo oo dhan. **20** Laakiinse haatan Masiixa ayaa kuwii
dhintay laga sara kiciyey, isagoo ah midhaha ugu horreeya
ee kuwa dhintay. **21** Dhimashadu nin bay ku timid, saas
aawadeed sarakicidda kuwii dhintayna nin bay ku timid. **22**
Siday dhammaan Aadan ugu wada dhintaan, sidaas oo kalaa
dhammaan Masiixa loogu wada noolayn doonaa, **23** laakiin
mid kasta markiisa, Masiixa midhaha ugu horreeya, markaas
kuwa Masiixana wakhtiga imaatinkiisa. **24** Markaasaa
dhammaadku iman doonaa, markuu isagu boqortooyada u
dhiibi doono Ilaaha Aabbaha ah, markuu baabbi'iyo madax
walba iyo amar walba iyo xoog walba dabadeed. **25** Waayo,
waa inuu wax xukumo ilaa uu cadaawayaashiisa oo dhan
cagihiisa hoostooda geliyo. **26** Oo cadaawaha ugu dambeeya
ee la baabbi'in doonaa waa dhimasho. **27** Waayo, Wax walba
cagihiisa hoostooduu geliyey. Laakiin markuu yidhaahdo,
Wax walba waa la hoos geliyey, way cad dahay in laga
reebay kan wax walba hoostiisa geliyey. **28** Markii wax
walba la hoos geliyo isaga, markaas ayaa Wiilka qudhiisana
la hoos gelin doonaa kan wax walba hoos geliyey isaga,
inuu Ilaah wax walba u ahaado dhammaan. **29** Haddii kale
maxay samayn doonaan kuwa loo baabtiisay kuwii dhintay?
Haddii aan kuwii dhintay la sara kicinba, maxaa haddana
loogu baabtiisaa iyaga? **30** Maxaynu saacad walba haalis
ugu jirnaa? **31** Faanka aan idiin qabo xagga Rabbigeenna
Ciise Masiix ayaan ku caddaynayaa, walaalayaalow, inaan
maalin walba dhinto. **32** Haddii aan sida dadka dugaag
ugu la dagaallamay Efesos, maxay ii taraysaa? Haddii aan
kuwii dhintay la sara kicin, aynu wax cunno oo cabno,
waayo, berrito waynu dhiman doonnaaye. **33** Yaan laydin
khiyaanayn, kuwa xun lasocodkoodu waa halleeya asluubta
wanaagsan. **34** Si qumman u toosa oo hana dembaabina,
waayo, qaar baan Ilaahba aqoonin. Waxaan taas u leeyahay
inaan idinka xishoodsiiyo. **35** Laakiin mid baa odhan doona,
Sidee baa kuwii dhintay loo sara kiciyaa? Oo jidh caynkee
ah bay ku yimaadaan? **36** Doqon yahow, waxaad adigu
beertid ma noolaado haddaanu dhiman. **37** Oo waxaad
beertidba ma beertid jidhka noqonaya, laakiin iniintoo qudha,
ha ahaato iniin sarreen ah, ama iniin cayn kale ah. **38**
Laakiin Ilaah wuxuu iyada siiyaa jidh siduu u doonayay, iniin
kastana jidhkeeda. **39** Hilib oo dhammu isku hilib ma aha,
laakiin waxaa jira hilibka dadka iyo hilibka kaloo dugaagga,
iyo hilibka kaloo shimbirraha, iyo hilibka kaloo kalluunka.
**40** Oo waxaa jira jidhadhka samada iyo jidhadhka dhulka,
laakiin ammaanta kuwa samadu waa mid, oo tan kuwa
dhulkuna waa mid kale. **41** Waxaa jirta ammaanta qorraxda
iyo ammaanta kaloo dayaxa iyo ammaanta kaloo xiddigaha,
waayo, xiddiguba xiddigta kale way ka ammaan duwan
tahay. **42** Sarakicidda kuwii dhintayna waa sidaas oo kale.
Waxaa lagu beeraa qudhun, waxaana lagu sara kiciyaa
qudhunla'aan. **43** Waxaa lagu beeraa maamuusla'aan,
waxaana lagu sara kiciyaa ammaan, waxaa lagu beeraa
itaaldarro, waxaa lagu sara kiciyaana xoog. **44** Waxaa
la beeraa jidh naf leh, waxaana la sara kiciyaa jidh ruux
leh. Hadduu jiro jidh naf leh, jidh ruux lihina waa jiraa. **45**
Haddaba waxaa qoran, Aadan oo ahaa ninkii ugu horreeyey
wuxuu noqday naf nool, Aadankii ugu dambeeyeyse wuxuu
noqday ruux wax nooleeya. **46** Hase ahaatee, kan ruuxa lihi
ma aha kii ugu horreeyey laakiin kan nafta leh, markaasna
kan ruuxa leh. **47** Ninkii ugu horreeyey waa kan dhulka oo
cammuud ah, ninkii labaadna waa kan jannada. **48** Sida
kan cammuudda ah kuwa cammuud ahina waa sidaas oo
kale, oo sida kan jannada, kuwa jannaduna waa sidaas oo
kale. **49** Oo sidaynu ugu eg nahay kan cammuudda ah,
sidaas oo kale ayaynu ugu ekaan doonnaa kan jannada. **50**

Waxaan leeyahay, walaalayaalow, Jidhka iyo dhiiggu ma
dhaxli karaan boqortooyada Ilaah. Qudhunkuna ma dhaxli
karo qudhunla'aanta. 51 Eega, waxaan idiin sheegayaa wax
qarsoon. Dhammaanteen ma wada dhiman doonno, laakiin
dhammaanteen waa layna beddeli doonaa, 52 dhaqsiba,
intaan il laysku qaban, markii buunka ugu dambeeya la
yeedhiyo; waayo, buunku waa dhawaaqi doonaa oo kuwii
dhintayna qudhunla'aan baa la sara kicin doonaa, waana
layna beddeli doonaa. 53 Waayo, kan qudhmayaa waa inuu
gashado qudhunla'aanta, oo kan dhimanayaana waa inuu
gashado dhimashola'aanta. 54 Markii kan qudhmayaa uu
gashado qudhunla'aanta, oo kan dhimanayaana uu gashado
dhimashola'aanta, markaas hadalka qorani wuu noqon
doonaa ee ah, Dhimashadii waxaa liqday libtii. 55 Dhimashoy,
meeday libtaadii? Dhimashoy, meeday micidaadii? **(Hadēs g86)**
56 Micida dhimashadu waa dembiga, oo xoogga dembiguna
waa sharciga. 57 Laakiin Ilaah baa mahad leh kan libta
inagu siiya Rabbigeenna Ciise Masiix. 58 Sidaa daraaddeed,
walaalahaygii aan jeclahayow, noqda kuwa adag, oo aan
dhaqaaqayn, oo had iyo goorba shuqulka Rabbiga si aad ah
u sameeya, idinkoo og hawshiinnu inayan khasaare ahayn
xagga Rabbiga.

**16** Haddaba sidaan u amray kiniisadihii Galatiya, inay wax
u ururshaan quduusiinta, idinkuna sidaas oo kale yeela.
2 Maalinta ugu horraysa ee toddobaadka midkiin kastaa
meel wax ha dhigo oo ha hayo wixii lagu barwaaqeeyey,
si markaan imaado aan waxba loo ururin. 3 Oo markaan
imaado, kuwaad u bogteen ayaan warqado u dhiibi doonaa,
oo waxaan u diri doonaa inay hadiyaddiinna Yeruusaalem
geeyaan. 4 Oo hadday ila noqoto inaan aniguna tago, way i
raaci doonaan. 5 Markaan Makedoniya soo maro dabadeed
ayaan idiin iman doonaa, waayo, Makedoniya waan soo
marayaa. 6 Mindhaa cabbaar baan idinla joogi doonaa, xataa
xilliga qabowga oo dhan, si aad iigu ambabbixisaan meel
alla meeshaan tegi doono. 7 Waayo, dooni maayo inaan
hadda idin arko markaan sii socdo, maxaa yeelay, waxaan
rajaynayaa inaan cabbaar idinla joogo, haddii Rabbigu
idmo. 8 Laakiin waxaan sii joogayaa Efesos ilaa maalinta
Bentekoste. 9 Waayo, waxaa la ii furay albaab weyn oo
shuqul ah, cadaawayaal badanina way jiraan. 10 Timoteyos
hadduu yimaado, dhawra, oo cabsila'aan ha idinkula joogo,
waayo, wuxuu ka shaqeeyaa shuqulka Rabbiga sidayda oo
kale. 11 Haddaba ninna yuusan fududaysan isaga. Laakiin
nabad ku soo ambabbixiya, ha ii yimaadee, waayo, waxaan
filanayaa inuu walaalaha soo raaco. 12 Xagga walaalka
Abolloos aad baan u baryay isaga inuu walaalaha sii raaco
oo idiin yimaado, laakiin raalli kama uu ahayn inuu haatan
yimaado, laakiin wuu iman doonaa markuu nefis helo. 13
Soo jeeda, iimaanka ku adkaada, rag ahaada, xoogooba.
14 Wax kastoo aad samaysaanba, jacayl ku sameeya. 15
Walaalayaalow, waad garanaysaan kuwa guriga Istefanas
jooga inay yihiin midhaha ugu horreeyey ee Akhaya iyo
inay isu bixiyeen inay quduusiinta u adeegaan. Waxaan
idinka baryayaa 16 inaad ka dambaysaan kuwaas oo kale
iyo mid kasta oo la shaqeeya oo hawshooda. 17 Waxaan
ku faraxsanahay imaatinka Istefanas iyo Fortunatos iyo
Akhaykos, maxaa yeelay, wixii xaggiinna ka dhinnaa iyagaa
dhammaystiray. 18 Waayo, ruuxayga iyo kiinnaba iyagaa
nasiyey. Taa aawadeed aqoonsada kuwaas oo kale. 19
Kiniisadaha Aasiya way idin soo salaamayaan. Akula iyo
Bariskillana aad bay idiin soo salaamayaan xagga Rabbiga,
iyaga iyo kiniisadda gurigooda ku taalba. 20 Walaalaha
oo dhammu way idin soo salaamayaan. Isku salaama
dhunkasho quduus ah. 21 Anigoo Bawlos ah ayaan salaantan
gacantayda ku qorayaa. 22 Qof uun hadduusan Rabbiga
jeclayn, ha inkaarnaado. Rabbigeennu waa imanayaa. 23
Nimcada Rabbi Ciise Masiix ha idinla jirto. 24 Dhammaantiin
jacaylkaygu ha idinla jiro xagga Ciise Masiix. Aamiin.

# 2 Korintos

1 Bawlos oo rasuulkii Ciise Masiix ku ah doonista Ilaah, iyo
walaalkeen Timoteyos waxaannu warqaddan u qoraynaa
kiniisadda Ilaah oo Korintos ku taal iyo kulli quduusiinta
Akhaya oo dhan jooga. 2 Nimco ha idinla jirto iyo nabad ka
timaada Ilaaha Aabbeheenna ah iyo Rabbi Ciise Masiix. 3
Waxaa barako leh Ilaaha ah Aabbaha Rabbigeenna Ciise
Masiix, oo ah Aabbaha naxariista leh iyo Ilaaha gargaarka
oo dhan, 4 kan naga gargaara dhibtayada oo dhan inaannu
kuwa dhib kasta ku jira ugu gargaari karno gargaarka Ilaah
nagu gargaaray. 5 Waayo, sida xanuunsigii Masiixu uu
noogu badan yahay, sidaas oo kalena gargaarkayagu xagga
Masiix wuu noogu badan yahay. 6 Haddii lana dhibo waa
gargaarkiinna iyo badbaadintiinna aawadood; haddii lana
gargaarona waa gargaarkiinna aawadiis kaasoo yeesha
dulqaadashada aannu ku dulqaadanno isku xanuunsiga
aannu annaguna ku xanuunsanno. 7 Oo rajadayada aannu
idiin qabnaa waa hubaal, annagoo garanayna inaad tihiin
kuwo xanuunsiga qayb ku leh, sidaas oo kalena waxaad tihiin
kuwo gargaarka qayb ku leh. 8 Walaalayaalow, dooni mayno
inaad ka garaad la'aataan waxa ku saabsan dhibtayada ee
xagga Aasiya nagaga dhacday, in hoos aad lanoogu celiyey
si xooggayaga dhaafsiisan, sidaas aawadeed ayaannu xataa
nolosha uga quusannay. 9 Laakiin annaga qudhayadu
waxaannu naftayada ku haysannay xukunka dhimashada,
inaannan naftayada isku hallayn, laakiin inaannu Ilaah
isku hallayno kan sara kiciya kuwii dhintay. 10 Isagaa
naga samatabbixiyey dhimasho saas u weyn, wuuna na
samatabbixin doonaa, kan aannu rajaynayno inuu weliba na
samatabbixin doono; 11 idinkoo nagu wada kaalmaynaya
baryadaad noo baridaan, in barakada lana siiyey kuwa badan
daraaddood, dad badan ay ku mahadnaqaan aawadayo. 12
Waxaannu ku faanaynaa, qalbigayaguna marag furayaa,
inaannu dunida ugu soconnay quduusnimo iyo daacadnimo
xagga Ilaah, ee uguma aan socon xigmadda jidhka laakiinse
nimcada Ilaah, oo khusuusan xaggiinna. 13 Wax kale idiin
soo qori mayno waxaad akhridaan oo aad garanaysaan
mooyaane, oo waanan rajaynayaa inaad sii garan doontaan
ilaa dhammaadka. 14 Sidaad si ahaan noogu garateen
inaannu faankiinna nahay, sidaas oo kale idinkuna kayagaad
tihiin maalinta Rabbigeenna Ciise. 15 Hubaalkaas daraaddiis
ayaan doonayay inaan horta idiin imaado inaad barako
labaad haysataan; 16 iyo inaan idin sii maro ilaa Makedoniya,
oo haddana aan Makedoniya ka imaado oo aan idinku soo
noqdo, idinkuna inaad xagga Yahuudiya ii ambabbixisaan.
17 Haddaba markaan waxaas doonayay miyaan rogrogay?
Ama waxaan goosto miyaan u goostaa sida uu ninka jidhka
raacaa u goosto, inay xaggayga noqoto, Haah, haah, iyo
Maya, maya? 18 Laakiin sida uu Ilaah aamin u yahay,
hadalkayagu xaggiinna ma aha, Haah, iyo Maya. 19 Waayo,
Wiilka Ilaah oo ah Ciise Masiix, ee aannu aniga iyo Silwanos
iyo Timoteyos dhexdiinna kaga wacdinnay, ma ahayn Haah
iyo Maya, laakiin xaggiisa waa Haah. 20 Waayo, in kastoo
ay badan yihiin ballamadii Ilaah, waxaa isaga xaggiisa ku
jira, Haahda, oo weliba xaggiisa waxaa ku jira, Aamiinta, in
xaggeenna Ilaah laga ammaano. 21 Laakiin kan ina wada
xoogeeya xagga Masiixa oo ina subkay waa Ilaah, 22 kan
haddana ina shaabadeeyey oo carbuunta Ruuxa inagu
siiyey qalbigeenna. 23 Laakiin Ilaah baan markhaati ugu
yeedhayaa xagga naftayda, waxaan Korintos u iman waayay
inaan idiin tudho. 24 Ma aha inaannu sayid u ahaanno
rumaysadkiinna, laakiin waxaannu nahay kuwa idinla wada
shaqeeya farxaddiinna aawadeed, waayo, rumaysad ayaad
ku taagan tihiin.

2 Laakiin waxaan aniga qudhaydu goostay inaanan haddana
caloolxumo idiinla imanin. 2 Waayo, haddaan idin
calool xumeeyo, waa kee kan iga farxinayaa kii aan calool
xumeeyey maahee? 3 Waxakan ayaan u qoray inaanan
markaan imaado ka calool xumaan kuwa aan ku farxi lahaa,
anigoo idinku aaminsan dhammaantiin inay farxaddaydu
tahay farxadda kulligiin. 4 Waayo, dhib badan iyo silica
qalbiga ayaan idinku soo qoray anigoo aad u ilmaynaya,
oo ma aha inaad calool xumaataan, laakiin inaad garataan
jacaylka aad u sii badan ee aan idiin qabo. 5 Laakiin mid
uuni hadduu qof calool xumeeyey, aniga ima uu calool
xumayn, laakiin dhammaantiin buu si ahaan idiin calool
xumeeyey; dooni maayo inaan idin culaysiyo. 6 Taqsiirtan
kuwa badani ay saareen way ku filan tahay kaasoo kale. 7
Laakiinse waa inaad isaga cafidaan oo u gargaartaan inaanay
sina caloolxumo aad u badani liqin kaasoo kale. 8 Sidaa
daraaddeed waxaan idinka baryayaa inaad jacaylkiinna u
caddaysaan isaga. 9 Waayo, taa aawadeed ayaan u qoray
inaan idin imtixaamo inaad wax walba ku dhega nugushihiin
iyo in kale. 10 Kii aad wax ka cafidaan, aniguna waan ka
cafiyaa: waxaan anigu ka cafiyeyna, haddaan wax ka cafiyey,
waxaan uga cafiyey aawadiin Masiix hortiisa, 11 inaan
Shayddaan inaga faa'iidaysan, waayo, innagu ma nihin kuwo
jaahil ka ah xeeladdiisa. 12 Markaan Taroo'as imid inaan
injiilka Masiix kaga wacdiyo, ee uu Rabbigu irid iga furay, 13
ruuxaygu ma nasan, waayo, ma aan helin walaalkay Tiitos,
laakiin iyagaan nabadgelyeeyey oo Makedoniyaan u kacay.
14 Ilaah baa mahad leh kan had iyo goorba libta inagu siiya

Masiix, oo meel walba udgoonka aqoontiisa gaadhsiiya,
ee innaga inaga gaadhsiiya. 15 Waayo, waxaynu Ilaah u
nahay udgoonka Masiix xagga kuwa badbaadaya iyo kuwa
lumayaba; 16 kuwa dambe udgoonka xagga dhimasho ilaa
dhimasho, kuwa kalena udgoonka xagga nolol ilaa nolol.
Oo yaa ku filan waxyaalahan? 17 Waayo, innagu la mid
ma nihin kuwa badan ee ereyga Ilaah ka baayacmushtara,
laakiin sida kuwa daacadda ah iyo kuwa Ilaah ayaynu Masiix
ugu hadallaa Ilaah hortiisa.

**3** Miyaannu bilaabaynaa inaannu haddana is-ammaanno?
Ama miyaannu u baahan nahay warqado ammaan ah in
laydiin diro ama in laydiinka soo diro sida qaar kale? 2 Idinku
waxaad tihiin warqaddayada ee qalbigayaga ku qoran, tan
ay dadka oo dhammu garanayaan oo akhriyaan, 3 idinkoo
muuqanaya inaad tihiin warqadda Masiixa ee ah taannu
ka adeegnay, ee aan khad lagu qorin, laakiinse lagu qoray
Ruuxa Ilaaha nool, oo aan lagu qorin looxyo dhagax ah
dushood laakiin lagu qoray looxyo qalbiyo jiidh ah dushood.
4 Hubaalkan oo kale ayaannu Masiix ku leennahay xaggii
Ilaah; 5 ma aha inaannu isku filan nahay inaannu wax ka
tashanno xagga qudhayada, laakiin iskufillaantayadu waa
xagga Ilaah, 6 kan haddana naga dhigay kuwa ku filan
inaannu ka adeegno axdiga cusub, ma aha xagga qorniinka,
laakiin xagga ruuxa, waayo, qorniinku wax buu dilaa, laakiin
ruuxu wax buu nooleeyaa. 7 Laakiin adeegidda dhimashada
keentaa ee qorniin lagu xardhay dhagaxyo, hadday ammaan
la ahaatay, si aan reer binu Israa'iil u karin inay Muuse
wejigiisa aad u eegaan ammaanta wejigiisa aawadeed ee ah
tan idlaanaysa, 8 sidaanay u ahayn adeegidda ruuxa inay
la ahaan doonto ammaan? 9 Waayo, hadday adeegidda
xukunka keentaa ammaan ahayd, adeegidda xaqnimada
keentaa aad bay uga ammaan badan tahay. 10 Waayo, wixii
ammaan lahaan jiray, ammaan kama lahayn wixii kan ku
saabsan, ammaanta ka sarraysa aawadeed. 11 Waayo,
haddii waxa idlaanayaa ammaan lahaan jiray, intee ka
badan baa waxa hadhaa ammaan leeyahay. 12 Haddaba
rajo caynkaas ah oo aannu leennahay aawadeed bayaan
ayaannu u hadalnaa. 13 Ma nihin sida Muuse, kan indho
shareertay inaan reer binu Israa'iil aad u eegin dhammaadka
tan idlaanaysay. 14 Laakiin fikirradoodii way adkaadeen.
Waayo, tan iyo maalintaas markii axdiga hore la akhriyo,
indho shareerkaas ayaa hadha isagoo aan laga saarin, kan
xagga Masiix ka idlaaday. 15 Laakiin tan iyo maalintaas mar
alla markii Muuse wax laga akhriyo dabool ayaa qalbigooda
saaran. 16 Laakiin mar alla markii loo soo leexdo Rabbiga
daboolka waa laga qaadaa. 17 Rabbigu waa Ruuxa, oo
meeshii Ruuxa Rabbigu joogana, waxaa jira xorriyad. 18
Laakiin dhammaanteen innagoo aan indho shareernayn,
ammaanta Rabbiga ayaynu arkaynaa sidii oo muraayad lagu
arko, oo isu-ekaanta ayaa laynoo roogayaa, ammaan ilaa
ammaan, sida tan xagga Rabbiga Ruuxa ah ka timaada.

**4** Sidaas daraaddeed sida lanoogu naxariistay, annagoo
haysanna adeegiddan, qalbi jabi mayno; 2 laakiin
waxaannu diidnay waxyaalihii qarsoonaa oo ceebta ahaa,
annagoo aan sirta ku soconaynin ama aan ereyga Ilaah
qalloocinaynin, laakiin muujinta runta ayaannu niyada dadka
oo dhan isugu bognaa Ilaah hortiisa. 3 Laakiin injiilkayagu
hadduu daboolan yahay, wuxuu ka daboolan yahay kuwa
lumaya. 4 Ilaaha wakhtigani wuu ka indho tiray maanka
kuwa aan rumaysanaynin, inaan iftiinka injiilka ee ammaanta
Masiix, kan ah u-ekaanta Ilaah, uu ifin iyaga. **(aiōn g165)**
5 Waayo, annaga qudhayadu idinkuma wacdinno wax
nagu saabsan, laakiin waxaannu idinku wacdinnaa wax
ku saabsan Ciise Masiix oo Rabbiga ah, iyo annagoo ah
addoommadiinna Ciise aawadiis. 6 Waayo, waa Ilaah kan
yidhi, Iftiin ha ka ifo gudcur, kan qalbiyadeenna uga ifay inuu
iftiinka aqoonta ammaanta Ilaah inaga siiyo Ciise Masiix
wejigiisa. 7 Laakiin khasnaddan ayaannu ku haysannaa
weelal dhoobo ah in xoogga weynaantiisa ay ka ahaato
xaggii Ilaah ee aanay xaggayaga ka ahaan. 8 Wax walba
waa lanagu dhibay, laakiin lanama cidhiidhiyin, waannu
qalbi walaacnay, laakiin ma aannu quusan, 9 waa lana
silciyey, laakiin lanama dayrin, hoos baa lanoo tuuray, laakiin
lanama baabbi'in. 10 Mar walba jidhkaannu ku sidnaa
dhimashada Ciise in haddana nolosha Ciise ay jidhkayaga
ka muuqato. 11 Waayo, annagoo nool waxaa weligayo lanoo
bixiyaa dhimasho Ciise aawadiis, in haddana nolosha Ciise
ka muuqato jidhkayaga dhimanaya. 12 Sidaa daraaddeed
annaga dhimashadu way naga dhex shaqaysaa, laakiin
noloshu idinkay idinka dhex shaqaysaa. 13 Waxaannu
leennahay isku ruuxa ee rumaysadka, sida qoran, waan
rumaystay, taas aawadeed ayaan u hadlay; annaguna waan
rumaysannaa, taas aawadeedna waannu u hadallaa. 14
Waannu garanaynaa in kan sara kiciyey Rabbi Ciise uu inala
sara kicin doono Ciise, oo hortiisuu ina wada keeni doonaa
idinka iyo annagaba. 15 Waayo, wax waliba waa aawadiin, in
nimcada kuwa badan ku badanu ay mahad u badiso xagga
ammaanta Ilaah. 16 Sidaa daraaddeed qalbi jabi mayno,
laakiin in kastoo ninkayaga dibadda ahu uu kharribmayo,
weliba kayaga gudaha ahu maalin kastuu cusboonaanayaa.
17 Waayo, dhibtayada fudud ee wakhtiga yar ah ayaa aad
iyo aad noogu sii yeesha culayska ammaanta ee weligiis
ah. **(aiōnios g166)** 18 Ma fiirsanno waxyaalaha la arko, laakiin

waxyaalaha aan la arkin, waayo, waxyaalaha la arko in
dhawr ah ayay sii joogaan, laakiin waxyaalaha aan la arkini
weligood bay sii joogaan. **(aiōnios g166)**

**5** Waayo, waxaynu og nahay, haddii gurigeenna dhulka
ee taambuug ahu uu dumo, inaynu Ilaah xaggiisa ku
leennahay dhismo, mana aha guri gacmo lagu sameeyey,
waase mid jannooyinka weligii ku jira. **(aiōnios g166)** **2** Kan
baynu ku dhex taahnaa innagoo u xiisoonayna inaynu
huwanno rugteenna xagga jannada ah. **3** Haddii aynu
huwan nahay laynama heli doono innagoo qaawan. **4**
Haddaba kuweenna taambuuggan ku jiraa waynu taahnaa,
innagoo layna culaysiyey, ma aha inaynu doonayno in
layna qaawiyo, laakiin in layna huwiyo, si ay noloshu u
liqdo waxa dhimanaya. **5** Maxaa yeelay, kan waxakan inoo
sameeyey waa Ilaah, kan carbuunta Ruuxa ina siiyey. **6**
Haddaba mar walba waynu kalsoon nahay innagoo og in
intaynu jidhka ku jirno aynu Rabbiga ka maqan nahay, **7**
waayo, waxaynu ku soconnaa rumaysadka ee ma aha
aragga. **8** Waynu kalsoon nahay, oo waxaynu ka jecel
nahay inaynu jidhka ka maqnaanno oo aynu Rabbiga la
joogno. **9** Sidaa daraaddeed haddaynu joogno iyo haddaynu
maqnaannoba aad baynu u doonaynaa inaynu isaga ka
farxinno. **10** Waayo, dhammaanteen waa in layna wada
muujiyo kursiga xukumaadda ee Masiix hortiisa, in qof
kastaa helo siday ahaayeen waxyaalihii uu jidhka ku falay, ha
ahaadeen wanaag ama share. **11** Sidaa daraaddeed annagoo
garanayna cabsida Rabbiga, ayaannu dadka aaminsiinnaa;
laakiin Ilaah waannu u muuqannaa, waana rajaynaynaa
inaannu qalbiyadiinnana u muuqanno. **12** Annagu haddana
isu kiin ammaani mayno, laakiin waxaannu idin siinaynaa
waxaad aawadayo ku faantaan, inaad lahaataan waxaad
ugu jawaabtaan kuwa wejiga ku faana ee aan qalbiga ku
faanin. **13** Maxaa yeelay, haddii aannu waalan nahay waa
Ilaah aawadiis, haddii aannu miyir qabnona waa aawadiin.
**14** Waayo, jacaylka Masiix ayaa na qasba, annagoo tan
xisaabna inuu mid dhammaan u dhintay, sidaa daraaddeed
ayay dhammaan dhinteen. **15** Isagu wuxuu u dhintay
dhammaan in kuwa nooli aanay u sii noolaan nafsaddooda
laakiin ay u sii noolaadaan kan aawadood u dhintay oo u
sara kacay. **16** Taa aawadeed tan iyo haddeer ninna jidhka
ku garan mayno, in kastoo aannu Masiix jidhka ku garan
jirnay, haddase isaga sidaas u sii garan mayno. **17** Sidaas
daraaddeed haddii qof Masiix ku jiro waa abuur cusub,
oo waxyaalihii hore way idlaadeen, bal eega, wax waliba
way cusboonaadeene. **18** Laakiin wax waliba waa xagga
Ilaah kan inagula heshiiyey Masiix, oo na siiyey adeegidda
heshiisnimada, **19** taas waxa weeye, Ilaah duniduu Masiix
kula heshiiyey, isagoo aan dembiyadooda ku xisaabaynin, oo
noo dhiibay hadalka heshiisnimada. **20** Sidaas daraaddeed
ergo ayaannu u nahay Masiix aawadiis, sidii Ilaah oo
idinka baryaya xaggayaga, Masiix aawadiis waxaannu idinku
baraynaa, Ilaah la heshiiya. **21** Wuxuu isaga oo aan dembi
aqoonin ka dhigay inuu dembi noqdo aawadeen, inaynu
noqonno xaqnimada Ilaah ee ku jirta isaga.

**6** Annagoo la shaqaynayna Ilaah waxaannu idinka
baryaynaa inaydnaan micnela'aan u qaadan nimcadii
Ilaah, **2** waayo, wuxuu leeyahay, Wakhti la aqbalay ayaan ku
dhegaystay, Oo maalintii badbaadintana ayaan ku caawiyey.
Bal eeg, hadda waa wakhtigii la aqbalay; bal eeg, hadda
waa maalintii badbaadinta. **3** Annagu ninna wax uu ku
turunturoodo uma dhigno, si aan adeegiddayada waxba
looga sheegin. **4** Laakiin sida midiidinyada Ilaah ayaannu wax
walba isugu caddaynaynaa dulqaadasho badan, annagoo
ku dhex jirna dhibaatooyin, iyo baahi, iyo cidhiidhiyo, **5**
iyo karbaashyo, iyo xabsiyo, iyo rabshooyin, iyo hawlo,
iyo soo jeedid, iyo soomid, **6** annagoo isku caddaynayna
daahirnimo, iyo aqoon, iyo samir, iyo roonaan, iyo Ruuxa
Quduuskaa, iyo jacayl aan labaweji lahayn, **7** iyo hadalka
runtaa, iyo xoogga Ilaah, iyo hubka xaqnimada ee midigta iyo
bidixdaba, **8** haddii lana maamuuso iyo haddii lana maamuus
jebiyoba, haddii war xun lanaga sheego, iyo haddii war
wanaagsan lanaga sheegoba, sida annagoo ah khaa'inno
laakiin kuwa runta ah; **9** sida kuwo aan la garanaynin laakiin
la yaqaan, sida kuwo dhimanaya, laakiin bal eeg, waannu
nool nahaye, sida kuwo la edbiyo, laakiin aan dhimasho la
gaadhsiin, **10** sida kuwo la calool xumeeyey, laakiin weli
had iyo goorba farxa, sida masaakiin, laakiin dad badan
hodansiiya, sida kuwo aan waxba haysanin laakiin wax
walba leh. **11** Afkayagu waa idiin furan yahay, idinka dadka
Korintosow, qalbigayaguna si weyn buu idiinku furan yahay.
**12** Annagu idinma aannan cidhiidhiyin, laakiin waxaa idin
cidhiidhiyey jacaylkiinna oo qudha. **13** Haddaba idinkuna
sidaas oo kale abaalgud ahaan u qalbi furnaada. Waxaan
idiinla hadlayaa sida carruutayda oo kale. **14** Ha noqonina
kuwo ku xidhan kuwa aan rumaysanaynin, waayo, sidee
bay xaqnimada iyo dembigu isu weheliyaan, ama sidee
bay iftiinka iyo gudcurku isu dhex galaan? **15** Oo sidee
bay Masiix iyo ina belaayo isku mid u yihiin? Ama maxaa
ka dhexeeya mid rumaysta iyo mid aan rumaysanaynin?
**16** Macbudka Ilaah sidee buu ula mid yahay sanamyada?
Waayo, innagu waxaynu nahay macbudka Ilaaha nool, siduu
Ilaah yidhi, Iyaga waan dhex joogi doonaa, waanan dhex

socon doonaa, Ilaahoodaan ahaan doonaa, oo iyaguna
dadkaygay ahaan doonaan. 17 Sidaa daraaddeed, Ka soo
baxa dhexdooda oo ka soocma, ayuu Rabbigu leeyahay, Oo
ha taabanina wax aan daahir ahayn, Waanan idin aqbali
doonaa. 18 Waxaan idiin ahaan doonaa Aabbe, Oo idinkuna
waxaad ii ahaan doontaan wiilal iyo gabdho, ayuu Rabbiga
Qaadirka ahu leeyahay.

7 Haddaba, gacaliyayaalow, innagoo ballamadan haysanna,
aan iska safayno nijaas kasta oo jidhka iyo ruuxa ku jirta,
innagoo quduusnimada kaamilayna oo Ilaah ka cabsanayna.
2 Qalbiyadiinna noo fura. Ninna ma aannu xumayn, ninna ma
aannu hallayn, ninna wixiisa ma aannu damcin. 3 U odhan
maayo inaan idin xukumo, waayo, markii hore ayaan idhi,
Qalbiyadayada ayaad ku jirtaan inaynu wada dhimanno oo
aynu wada noolaanno. 4 Iimaan weyn ayaan idinku qabaa,
oo aad baan idiinku faanaa. Dhiirranaan baa iga buuxda, oo
mar kastoo aan dhibaataysan nahayna farxad ayaa aad iiga
badata. 5 Waayo, markaannu Makedoniya nimid jidhkayagu
ma nasan, laakiin wax kasta waannu ku dhibtoonnay. Xagga
dibadda waxaa jiray dagaallo, xagga gudahana waxaa jirtay
cabsi. 6 Laakiin Ilaaha dhiirigeliya kuwa is-hoosaysiiya
ayaa nagu dhiirrigeliyey imaatinka Tiitos; 7 mana aha
imaatinkiisa oo keliya, laakiin wuxuu nagu dhiirrigeliyey
dhiirrigeliskii aad isaga dhiirrigeliseen. Wuxuu noo sii sheegay
xiisaha iyo caloolxumaanta iyo dadaalka aad ii qabtaan,
si aan weliba aad ugu sii farxay. 8 Waayo, in kastoo aan
warqaddaydii idinku calool xumeeyey, kama qoomameeyo,
in kastoo aan markii hore ka qoomameeyey, waayo, waxaan
gartay warqaddaas inay idin calool xumaysay, saacadna ha
ahaatee. 9 Haddana waan ku farxayaa, mana aha inaad si
kale u calool xumaateen, laakiin inaad u calool xumaateen
toobadkeenidda, waayo, waad u calool xumaateen sida
Ilaah doonayay, inaanad waxba xaggayaga ku khasaarin.
10 Maxaa yeelay, caloolxumaanta ah sida Ilaah doonayo
waxay keentaa toobadda xagga badbaadada ee aan laga
qoomamayn, laakiin caloolxumaanta dunidu waxay keentaa
dhimasho. 11 Bal ogaada, waxakan aad ka calool xumaateen
sida Ilaah doonayay wuxuu dhexdiinna ka soo saaray dadaal,
iyo iscaddayn, iyo cadho, iyo cabsi, iyo xiiso, iyo qiiro, iyo
ciqaabid waaweyn. Wax walba waad isku caddayseen inaad
xaalka ku eedla'dihiin. 12 Haddaba in kastoo aan idiin soo
qoray, uma aan qorin kan wax xumeeyey aawadiis, ama kan
la xumeeyey aawadiis, laakiin in dadaalka aad noo qabtaan
laydinka muujiyo Ilaah hortiis. 13 Sidaa aawadeed waa lana
dhiirrigeliyey. Dhiirrigeliskii aad na dhiirrigeliseenna farxad ka
sii badan ayaannu ku faraxnay, farxadda Tiitos aawadeed,
waayo, dhammaantiin ruuxiisaad nasiseen. 14 Waayo, haddii
aan xaggiisa wax uun idinku faaniyey, ma aan ceeboobin,
laakiin wax walba run ahaan ayaannu idinkula hadalnay,
sidaas oo kale ayaa faankayagii aan Tiitos u sheegay
run u noqday. 15 Jacaylkiisuna wuu ku sii badan yahay
xaggiinna, maxaa yeelay, wuxuu xusuustaa dhammaantiin
addeeciddiinna iyo sidaad idinkoo cabsanaya oo gariiraya u
dhowayseen. 16 Waan ku faraxsanahay inaan wax walba
kalsooni weyn idiinku qabo.

8 Haddaba, walaalayaalow, waxaannu idin ogeysiinaynaa
nimcada Ilaah oo la siiyey kiniisadaha Makedoniya,
2 si, markii dhib lagu tijaabiyey, farxaddooda badan iyo
miskiinnimadooda weyni ay ugu badnaadeen hodantinimada
deeqsinimadooda. 3 Waayo, waxaan u marag furayaa inay
tabartooda ku siiyeen, oo weliba si dhaafsiisan tabartooda,
siday u doonayeen, 4 iyagoo aad nooga baryaya inaannu
ka guddoonno hadiyadda qaybta ku leh adeegidda xagga
quduusiinta, 5 oo mana aha sidaan rajaynay, laakiin hortii
way isa siiyeen Rabbiga iyo annagaba sidii Ilaah doonayay.
6 Sidaas daraaddeed Tiitos waannu ka barinnay, in siduu
hortii u bilaabay, sidaas oo kale uu idiinku dhammeeyo
nimcadatan. 7 Laakiin sidaad wax kasta badnaan uga
haysaan xagga rumaysadka, iyo hadalka, iyo aqoonta, iyo
dadaalka oo dhan, iyo jacaylka aad noo qabtaan, waa
inaad nimcadanna badnaan uga haysaan. 8 U hadli maayo
amar ahaan, laakiin inaan dadaalka kuwa kale ku caddeeyo
lillaahinimada jacaylkiinna. 9 Waad garanaysaan nimcada
Rabbigeenna Ciise Masiix in isagoo hodan ah uu aawadiin
miskiin u noqday, inaad miskiinnimadiisa hodan ku noqotaan.
10 Oo sidan ayaan idinkula talinayaa, waayo, tanu way idiin
dhaantaa idinkoo ah kuwii sannaddii hore ugu hor bilaabay
inay sameeyaan, mana aha inaad samaysaan oo keliya,
laakiin waanad doonaysaan. 11 Laakiin hadda shaqaddii
dhammeeya, in sidaad diyaar u ahaydeen, aad haddana ugu
dhammaysaan waxaad awooddaan. 12 Waayo, haddii diyaar
la yahay, sida loo haysto ayaa loo aqbalaa ee ma aha sidaan
loo haysan. 13 Waayo, tan u odhan maayo in kuwa kale la
daayo oo idinka laydin dhibo, 14 laakiin sida ay sinnaantu
tahay, wax ka siiya waxa badan ee aad wakhtigan la joogo
haysataan, waayo, way baahan yihiin, inay waxooda badan
wax idinka siiyaan markaad baahataan, si ay sinnaani u
dhacdo, 15 sida qoran, Kii wax badan soo gurtay, waxba
uma hadhin, kii wax yar soo gurtayna, waxba kama dhinmin.
16 Laakiin Ilaah baa mahad leh kan qalbiga Tiitos geliyey
dadaalka aan idiin qabno oo kale. 17 Waayo, wuu aqbalay
baryadayadii, laakiin isaga qudhiisu aad buu u doonayaa
inuu idiin yimaado, maxaa yeelay, wuu idiin xiisoonayaa.

18 Waxaannu isaga la dirnay walaalka ammaantiisa xagga
injiilku kiniisadaha oo dhan wada gaadhay. 19 Sidaas oo
keliyana ma aha, laakiin isagu waa kii ay kiniisaduhu ka
dhigeen inuu nala socdaalo hadiyaddan aawadeed tan
aannu uga adeegno Rabbiga ammaantiisa aawadeed iyo
in la arko diyaarnimadayada. 20 Waxaannu iska jiraynaa
inaan qofna nagu masabidin deeqsinimadan aannu ka
adeegno, 21 waayo, waxaannu ka tashannaa waxyaalaha
wanaagsan, mana aha Rabbiga hortiisa oo keliya, laakiin
dadka hortiisana. 22 Waxaannu iyaga la dirnay walaalkeen
kan aannu marar badan caddaynay inuu waxyaalo badan ku
dadaalo, haddeerna weliba wuu ka sii dadaal badan yahay
hubaasha weyn ee uu xaggiinna ku qabo aawadeed. 23
Tiitos waxaa weeyaan wehelkayga iyo ila-shaqeeyahayga
xaggiinna; walaaleheenna waa kuwa kiniisaduhu idiin soo
direen, waana yihiin ammaanta Masiix. 24 Sidaa daraaddeed
kiniisadaha hortooda iyaga caddaan ugu tusa jacaylkiinna
iyo faanka aannu idiin qabno.

9 Looma baahna inaan idiin soo qoro wax ku saabsan
caawimaadda xagga quduusiinta, 2 waayo, waan
garanayaa diyaarnimadiinna aan kuwa Makedoniya idinku
faaniyey, in dadka Akhaya sannaddii hore ay diyaar
ahaayeen, oo jacaylkiinna kulaylkiisuna badidood buu sii
kiciyey. 3 Laakiin waxaan u dirayaa walaalaha si aan faanka
aannu idinku faaninnay micnela'aan loogaga dhigin xaalkan,
inaad diyaar u ahaataan sidaan idhi, 4 waaba intaasoo
aannu faankan ku ceebownaaye, annagoo keliyana ma aha,
laakiin idinkuna waad ku ceeboobaysaan, haddii kuwo reer
Makedoniya ahi ay i soo raacaan oo ay idin arkaan idinkoo
aan diyaar ahayn. 5 Taas aawadeed waxaan u maleeyey
inay dhaanto inaan walaalaha ka baryo inay hortay idiin
yimaadaan, inay hore diyaar uga sii dhigaan deeqda aad
ballanqaaddeen, inay taasi diyaar u ahaato deeq ahaan,
mana aha qasab ahaan. 6 Laakiin tan ogaada, Kii wax yar
beeraa, wax yar buu goostaa, kii wax badan beeraana, wax
badan buu goostaa. 7 Qof kastaa wax ha u bixiyo siduu
qalbiga ka goostay, oo yaanu ku bixin caloolxumo ama qasab,
waayo, Ilaah wuxuu jecel yahay kan farxad wax ku bixiya. 8
Ilaah wuxuu karaa inuu nimco oo dhan idiin badiyo inaad
mar walba wax kasta oo idinku filan haysataan inaad shuqul
kasta oo wanaagsan ku badisaan; 9 sida qoran, Isagu wuu
kala firdhiyey, masaakiintana wax buu siiyey, Xaqnimadiisuna
way sii jirtaa weligeedba. **(aiōn g165)** 10 Kii beerreyga siiya
abuur uu abuuro iyo kibis uu cuno, wuu siin doonaa wuuna
badin doonaa abuurkiinna aad abuuraysaan, wuuna kordhin
doonaa midhaha xaqnimadiinna. 11 Wax kasta idinka waa
laydinku hodansiin doonaa xagga deeqsinimada inaga dhex
shaqaysa oo dhan ee aawadeed Ilaah loogu mahadnaqo.
12 Waayo, samaynta shuqulkani ma dhammaystirto waxa
dhiman ee ay quduusiintu u baahan yihiin oo qudha, laakiin
waxaa kale oo ay kordhisaa in Ilaah aad loogu mahadnaqo.
13 Caddaynta adeegiddan aawadeed, waxaa Ilaah loo
ammaanaa addeeciddiinna markaad qirataan injiilka Masiix,
iyo deeqsinimada markaad la wadaagtaan iyaga iyo dadka
kale oo dhan. 14 Way idiin duceeyaan, wayna idiin xiisoodaan
nimcada aad u badan ee Ilaah ee idinku jirta aawadeed.
15 Ilaah baa mahad leh hadiyaddiisa aan la sheegi karin
aawadeed.

10 Aniga qudhayda oo Bawlos ah waxaan idinku baryayaa
qabownimada iyo raxmadda Masiixa, anigoo is-
hoosaysiiya markaan dhexdiinna joogo, laakiin xaggiinna
geesi ku ah markaan idinka maqnahay. 2 Laakiin waxaan
idinka baryayaa inaanan anigu markaan joogo geesi ku
ahaan hubaashaas aan u malaynayo inaan geesi ku ahaado
xagga kuwa nagu tirinaya inaannu sida jidhka ku soconno.
3 Maxaa yeelay, in kastoo aannu jidhka ku soconno, sida
jidhka uma dagaallanno, 4 waayo, hubka dagaalkayagu
ma aha xagga jidhka, laakiin xoog bay leeyihiin Ilaah
hortiisa in qalcado lagu dumiyo. 5 Waxaannu baabbi'innaa
murannada, iyo wax kasta oo sarreeya oo aqoonta Ilaah
iska sarraysiiya, oo fikir kasta maxbuus baannu ka dhignaa,
si uu Masiix u addeeco, 6 annagoo u diyaar ah inaannu
ka aarsanno caasinimo oo dhan markii ay addeeciddiinnu
kaamil noqoto. 7 Waxaad eegaysaan waxa idin hor yaal.
Haddii qof uun isku hubo inuu ka mid yahay kuwa Masiix,
midkaasi mar kale isaga qudhiisu ha ka fiirsado in, siduu
isagu uga mid yahay kuwa Masiix, aannu annaguna uga
mid nahay. 8 Waayo, in kastoo aan si badan ugu faanayo
amarkayaga uu Rabbigu noo siiyey inaannu idinku dhisno
ee aanu noo siin inaannu idinku duminno, weliba layma
ceebayn doono. 9 Tan waxaan u idhi inaanan u ekaan
sidii anigoo warqadahayga idinku cabsiinaya. 10 Waayo,
waxay yidhaahdaan, Warqadihiisu culays iyo xoog bay
leeyihiin, laakiin joogidda jidhkiisu way tabardaran tahay,
oo hadalkiisana waa la fududaystaa. 11 Kaasoo kale ha
ogaado in sidaannu xagga hadalka warqadaha ku nahay
markaannu maqan nahay, aannu xagga falimaha ku nahay
markaannu joogno. 12 Waayo, kuma dhacno inaannu isku
tirinno ama isu ekaysiinno kuwa is-ammaana. Laakiin iyaga
qudhooda oo isku qiyaasaya qudhooda oo isu ekaysiinaya
qudhooda waa garaadlaawayaal. 13 Isu faanin mayno si
qiyaastayada dhaafsiisan, laakiin sida ay tahay qiyaasta

Ilaah noo qaybiyey inay qiyaas ahaato, si aannu idiin soo
gaadhno. 14 Waayo, annaga qudhayadu si dhaafsiisan isugu
kala bixin mayno sidii annagoo aan idin soo gaadhin; waayo,
xataa idinka ayaannu idiinla nimid injiilka Masiix, 15 annagoo
aan si dhaafsiisan uga faanayn hawlihii dadka kale, laakiin
rajo u leh intuu rumaysadkiinnu korayo inaannu aad iyo
aad ugu weynaan doonno dhexdiinna sida soohdintayada
ah, 16 si aannu injiilka ugu wacdinno meelaha idinka
shisheeya oo aanan ku faanin waxa laga diyaariyey qof kale
soohdintiisa. 17 Kii faanaa, Rabbiga ha ku faano. 18 Ma
aha ka qudhiisa ammaana ka loo bogaa, laakiin waa ka uu
Rabbigu ammaano.

11 Waxaan jeclaan lahaa inaad iigu dulqaadataan
doqonnimadayda yar. Laakiin waad ii dulqaadataan. 2
Waxaan idiinku masayrsanahay masayr xagga Ilaah ah,
waayo, waxaan idiin guuriyey nin keliya, inaan idiin dhiibo
Masiix idinkoo ah bikrad daahir ah. 3 Laakiin waxaan ka
baqayaa in maankiinna laga halleeyo lillaahinimada iyo
daahirnimada xagga Masiix, sidii abeesadii xeeladdeedii
Xaawa ugu khiyaanaysay oo kale. 4 Waayo, haddii mid
yimaado oo idinku wacdiyo Ciise kale oo ah ku aanan
ku wacdiyin, ama haddii aad heshaan ruux ka duwan
kii aad hesheen, ama injiil ka duwan kii aad aqbasheen,
si wanaagsan ayaad ugu dulqaadataan. 5 Waxaan u
malaynayaa inaanan sina uga liidan rasuulladaas ugu
waaweyn. 6 Laakiin in kastoo aanan hadalka ku fiicnayn,
aqoonta waan ku fiicanahay, oo taasaannu si kasta idiinku
muujinnay dadka oo dhan hortiisa. 7 Dembi miyaan falay
markaan is-hoosaysiiyey in idinka laydin sarraysiiyo, maxaa
yeelay, injiilka Ilaah ayaan idinku wacdiyey hadiyad ahaan?
8 Kiniisado kale ayaan dhacay, anigoo mushahaaro ka
qaadaya, si aan idiinku adeego. 9 Markaan idinla joogay
oo aan wax u baahnaa, ninna culays kuma aan hayn,
waayo, walaalihii markay Makedoniya ka yimaadeen waxay ii
dhammaystireen waxaan u baahnaa, oo si kastana waan isu
celiyey si aanan idiin culaysin, waanan isa sii celin doonaa.
10 Sida Masiixa runtiisu ay iigu jirto, faankan laygama joojin
doono xagga dalalka Akhaya. 11 Waayo? Ma waxay tahay
inaanan idin jeclayn? Ilaah baa garan. 12 Laakiin waxaan
samaynayo, waan sii samayn doonaa, inaan ka gooyo waxay
kuwa doonaya inay wax ku faanaan ku faani lahaayeen, in
waxay ku faanaan loo garto inay sidayada oo kale yihiin. 13
Kuwaas oo kale waa rasuullo been ah iyo shaqeeyayaal
khaa'inno ah iyagoo isu ekaysiinaya rasuullada Masiix. 14
Oo layaabna ma leh, waayo, Shayddaanka qudhiisu wuxuu
isu ekaysiiyaa malaa'igta iftiinka. 15 Haddaba wax weyn ma
aha haddii ay midiidinyadiisuna isu ekaysiiyaan midiidinyada
xaqnimada, iyagoo dhammaanshahoodu u ahaan doono
sida shuqulladooda. 16 Haddana waxaan leeyahay, Qofna
yaanu doqon ii malayn, laakiin haddaad ii malaysaan, weliba
sida doqon ii qaata inaan aniguna in yar faano. 17 Waxaan
ku hadlayo ugu hadli maayo sida Rabbigu doonayo, laakiin
si doqonnimo ah iyo si geesinimadan faanka ah ayaan
ugu hadlayaa. 18 Siday kuwa badanu jidhka ugu faanaan,
ayaan anna ugu faani doonaa. 19 Waayo, idinku si farxadleh
ayaad doqonnada ugu dulqaadataan idinkoo caqli leh. 20
Idinku waad u dulqaadataan nin hadduu idin addoonsado,
hadduu wixiinna cuno, hadduu wax idinka qaato, hadduu isa
sarraysiiyo, hadduu wejiga idinka dharbaaxo. 21 Waan ka
xishoonayaa inaan idhaahdo, Waannu tabardaran nahay.
Laakiin weliba wax kasta oo uu qof geesi ku yahay, aniguna
geesi baan ku ahay (sida doqon ayaan u hadlayaa). 22
Iyagu ma Cibraaniyo baa? Anna waan ahay. Ma reer binu
Israa'iil baa? Anna waan ahay. Ma dhashii Ibraahim baa?
Anna waan ahay. 23 Iyagu ma Masiix bay u adeegaan? Si
ka sii badan ayaan ugu adeegaa. Sidii qof waalan ayaan
u hadlayaa. Waan ka hawlo badnaa, waanan ka xabsi
badnaa, karbaashyo tirola'aan ahna waa laygu dhuftay,
marar badanna dhimashaan ku dhowaaday. 24 Shan goor
Yuhuuddu waxay i karbaasheen afartan mid la'. 25 Saddex
goorna ulaa laygu dhuftay, marna waa lay dhagxiyey, saddex
goor doonni baa ila jabtay, habeen iyo maalinna waxaan ku
jiray badda. 26 Marar badan baan safray, xagga webiyadana
khatar baan galay, xagga tuugaggana khatar baan galay,
xagga dadkaygana khatar baan galay, xagga dadka aan
Yuhuuddu ahaynna khatar baan galay, xagga magaaladana
khatar baan galay, xagga cidladana khatar baan galay, xagga
baddana khatar baan galay, walaalo been ah dhexdoodana
khatar baan ku galay. 27 Waxaanna ku jiray dhib iyo daal,
marar badanna hurdola'aan iyo gaajo iyo harraad, marar
badanna cuntola'aan iyo qabow iyo arrad. 28 Waxyaalahaas
dibadda ahna waxaa ii dheeraad ah waxaa maalin walba i
dhiba ee ah kawelwelidda kiniisadaha oo dhan. 29 Kumaa
itaaldaran oo anna aanan itaal darnayn? Kumaa la xumeeyey
oo aanan ka guban? 30 Hadday tahay inaan faano waxaan
ku faanayaa waxyaalaha ku saabsan itaaldarradayda. 31
Ilaaha ah Aabbaha Rabbi Ciise, kan barakada leh weligiis,
wuxuu yaqaan inaanan been sheegaynin. **(aiōn g165)** 32
Xagga Dimishaq taliyihii ka hooseeyey boqorkii Aretas ahaa
ayaa gaadh ka qabtay magaalada reer Dimishaq si uu ii
qabto. 33 Markaas anigoo dambiil ku jira ayaa daaqad
xagga derbiga hoos laygaga dejiyey oo aan gacmihiisii ka
baxsaday.

**12** Waa inaan faano in kastoo aanay waxtar lahayn, laakiin
waxaan gaadhi doonaa riyooyin iyo waxa Rabbigu
muujiyo. 2 Waxaan garanayaa nin Masiix ku jira oo afar
iyo toban sannadood ka hor kor loo qaaday ilaa samada
saddexaad. Inuu jidhka ku jiray iyo inaanu jidhka ku jirin
garan maayo, Ilaah baase garan. 3 Oo waxaan garanayaa
ninkaas, laakiin inuu jidhka ku jiray iyo inaanu jidhka ku
jirin garan maayo, Ilaah baase garan. 4 Isaga kor baa
loogu qaaday Firdooska, oo wuxuu maqlay erayo aan lagu
hadlin oo aan nin loo idmin inuu ku hadlo. 5 Kaasoo kale
xaggiisa waan ku faani doonaa, laakiin xaggayga kuma
faani doono, itaaldarradayda mooyaane. 6 Waayo, haddaan
dooni lahaa inaan faano, doqon ma ahaan doono, waayo,
runtaan ku hadli doonaa; laakiin waan iska celiyaa inaanu
qofna ii malayn mid ka weyn wuxuu igu arko ama iga
maqlo. 7 Inaanan isu sarraysiin waxyaalaha lay muujiyey
weynaantooda dheer aawadeed, waxaa lay siiyey wax
jidhkayga muda oo ah mid Shayddaan uu soo diray inuu
i kadeedo, si aanan isu sarraysiin. 8 Waxaas aawadiis
saddex goor ayaan Rabbiga ka baryay in waxaasi iga
fogaado. 9 Oo isagu wuxuu igu yidhi, Nimcadaydu way kugu
filan tahay; maxaa yeelay, xooggaygu wuu ku dhan yahay
itaaldarrada. Sidaa aawadeed anigoo faraxsan ayaan ku
faanayaa itaaldarrooyinkayga in xoogga Masiixu igu soo
dego. 10 Sidaa aawadeed waxaan ku farxaa itaaldarrooyin
iyo hadallo cay ah iyo baahiyo iyo silecyo iyo dhibaatooyin
Masiix aawadiis, waayo, markaan itaal daranahay, ayaan
xoog badnahay. 11 Doqon baan noqday; idinkaase igu
qasbay. Waxay ahayd inaad i ammaantaan, waayo, sinaba
ugama aan liidan rasuulladii ugu wada waaweynaa, in kastoo
aanan waxba ahayn. 12 Hubaal rasuul calaamooyinkiis ayaa
si dulqaad leh laydiinka dhex sameeyey xagga calaamooyin
iyo yaabab iyo shuqullo xoog leh. 13 Maxaa idinka dhiman oo
aad uga liidataan kiniisadaha kale, anigoo aan idin culaysin
mooyaane? Xumaantan aawadeed iga raalli ahaada. 14
Markan waa markii saddexaad oo aan diyaar u ahay inaan
idiin imaado; oo idinma culaysin doono, maxaa yeelay,
idinkaan idin doonayaa ee ma doonayo wixiinna; waayo, ma
aha inay carruurtu waalidkood wax u kaydiso, laakiin waa
inuu waalidku carruurta wax u kaydiyo. 15 Anna si farxad leh
ayaan isu bixin, naftiinnaanan isu bixin. Haddii aan aad idiin
jeclahay, ma si ka yar baa lay jecel yahay? 16 Hase ahaatee,
anigu idinma aan culaysin, laakiin khaa'in baan noqday oo sir
baan idinku qabtay. 17 Miyaan faa'iido ahaan wax idiinkaga
qaatay kuwii aan idiin soo diray midkoodna? 18 Tiitos waan
waaniyey, walaalkeenna waan la diray isagii. Tiitos miyuu
faa'iido ahaan wax idiinkaga qaatay? Miyaannan isku ruux
ku socon? Miyaannan isku tallaabooyin ku socon? 19 Haatan
waxaad u malaynaysaan inaannu iska kiin daafacayno.
Ilaah hortiisa waxaannu u hadlaynaa sida kuwo Masiix, oo
gacaliyayaalow, wax kastaba waxaannu u samaynaa si aad
u dhisantaan. 20 Waayo, waxaan ka cabsanayaa in, kolkaan
imaado, aan idinka waayo sidaan doonayo inaad ahaataan,
idinna aad iga weydaan sidaad doonaysaan inaan ahaado,
waaba intaasoo ay jiraan dirir, iyo masayr, iyo xanaaq, iyo
iskala qaybqaybin, iyo cay, iyo xan, iyo qabweynaan, iyo
rabshooyin; 21 waaba intaasoo kolkaan mar kale imaado uu
Ilaahay hortiinna igu hoosaysiiyaa, oo aan u baroortaa kuwo
badan oo hadda ka hor dembaabay, oo aan ka toobadkeenin
wasakhnimadii iyo sinadii iyo nejisnimadii ay faleen.

**13** Socodkan aan idiin imanayo waa kaygii saddexaad.
Laba ama saddex markhaati afkooda ayaa eray walba
lagu xaqiiqayn doonaa. 2 Markii horaan idhi, haddana waan
leeyahay; sidaan idinku idhi markii labaad oo aan idinla
joogay, ayaan haatanna anoo idinka maqan ku leeyahay
kuwii hadda ka hor dembaabay iyo inta kale oo dhanba in
haddaan mar kale imaado, aanan u tudhayn iyaga, 3 waayo,
waxaad doondoonaysaan wax caddeeya in Masiixu iga dhex
hadlayo, kan aan xaggiinna ku itaalka yarayn, laakiinse
dhexdiinna ku xoogga badan. 4 Waayo, isagoo itaaldaran
ayaa iskutallaabta lagu qodbay, laakiin wuxuu ku nool yahay
xoogga Ilaah. Annaguba isaga waannu la itaal yar nahay,
laakiin isagaannu xaggiinna kula noolaan doonnaa xoogga
Ilaah. 5 Isjirraba inaad iimaanka ku jirtaan iyo in kale, oo
bal istijaabiya. Oo miyeydnaan is-ogayn in Ciise Masiix
idinku jiro haddaydnan ahayn kuwo aan loo bogin? 6 Laakiin
waxaan rajaynayaa inaad ogaan doontaan inaannan ahayn
kuwo aan loo bogin. 7 Hadda waxaannu Ilaah ka baryaynaa
inaydnaan wax shar ah samayn, mana aha inaannu annagu
u muuqanno sidii kuwo loo bogay, laakiinse waa inaad idinku
samaysaan waxa wanaagsan, in kastoo aannu nahay sidii
kuwo aan loo bogin. 8 Waayo, annagu ma samayn karno wax
runta ka gees ah, laakiinse waxaannu samayn karnaa wax
runta la jira. 9 Waayo, waannu ku faraxnaa markaannu itaal
yar nahay, idinkuna aad itaal weyn tihiin. Wax kalena Ilaah
baannu ka baryayna oo waa kaamilnimadiinna. 10 Sababtan
aawadeed ayaan waxyaalahan u qoray intaan maqnaa,
si aanan markaan joogo si adag idiinkula macaamiloon
sida amarkii Rabbigu ii siiyey inaan idinku dhiso oo aanan
idinku dumin. 11 Ugu dambaysta, walaalayaalow, waxaan
idinku leeyahay, Nabadgelyo. Qummanaada, dhiirranaada,
isku fikir ahaada, nabad ku jooga, oo Ilaaha jacaylka iyo
nabaddu wuu idinla joogi doonaa. 12 Dhunkasho quduus ah

midkiinba midka kale ha ku salaamo. 13 Quduusiinta oo
dhammi way idin soo salaamayaan. 14 Nimcada Rabbi Ciise
Masiix iyo jacaylka Ilaah iyo wehelnimada Ruuxa Quduuska
ahu kulligiin ha idinla jireen.

# Galatiya

1 Waxaa warqaddan qoraya Bawlos oo ah rasuul aan
xagga dadka ka iman, oo aan dadna ku iman, laakiinse
ku yimid Ciise Masiix iyo Ilaaha Aabbaha ah oo isaga ka
sara kiciyey kuwii dhintay. 2 Aniga iyo walaalaha ila jooga oo
dhammi waxaannu tan u qoraynaa kiniisadaha Galatiya. 3
Nimco ha idinla jirto iyo nabad ka timaada Ilaaha Aabbaha
ah iyo Rabbigeenna Ciise Masiix, 4 kan naftiisii u bixiyey
dembiyadeenna aawadood, si uu inooga bixiyo dunidatan la
joogo oo sharka leh sida ay tahay doonista kan Ilaah iyo
Aabbe inoo ah. **(aiōn g165)** 5 Isagaa ammaanta leh weligiis
iyo weligiis. Aamiin. **(aiōn g165)** 6 Waxaan la yaabsanahay
dhaqsiiyaha aad uga dhaqaaqaysaan kii nimcada Masiixa
idiinku yeedhay, oo aad u leexanaysaan injiil kale, 7 oo
aan ahayn mid kale, laakiin waxaa jira kuwo idin dhibaya,
oo doonaya inay injiilka Masiixa qalloociyaan. 8 Laakiinse
annaga ha noqoto ama malaa'ig samada ka timid ha noqotee,
kii idinku wacdiya injiil aan ahayn kaannu idinku wacdinnay,
ha inkaarnaado. 9 Sidii aannu markii hore nidhi, waxaan
haatanna leeyahay, Haddii nin idinku wacdiyo injiil kale oo
aan ahayn kii aad aqbasheen, ha inkaarnaado. 10 Ma waxaan
haatan is-oggolaysiinayaa dadka mise Ilaah? Mise waxaan
doondoonayaa inaan dadka ka farxiyo? Haddaan weli dadka
ka sii farxinayo, ma aanan ahaadeen addoonkii Masiixa.
11 Walaalayaalow, waxaan idin ogaysiinayaa in injiilka aan
idinku wacdiyey uusan ka iman xagga dadka. 12 Waayo,
kama aan helin xagga dadka, laymana barin, laakiin waxaa
ii muujiyey Ciise Masiix. 13 Waad maqasheen dabiicaddaydii
hore xagga diintii Yuhuudda, sidii aan kiniisaddii Ilaah aad
iyo aad ugu silcin jiray oo u kharribi jiray. 14 Oo kuwa badan
oo asaaggay ah oo aan isku waddan nahay ayaan kaga
hor maray diinta Yuhuudda, anigoo aad iyo aad ugu adag
xeerarkii awowayaashay. 15 Laakiin Ilaaha uurkii hooyaday
iga doortay, oo nimcadiisa iigu yeedhay, markuu ku farxay 16
inuu Wiilkiisa iga dhex muujiyo inaan dadka aan Yuhuudda
ahayn ku wacdiyo isaga warkiisa, isla markaasba lama
aan tashan bini aadan. 17 Yeruusaalemna uma aan aadin
kuwii hortay rasuullada ahaa, laakiinse waxaan aaday dalka
Carabta, dabadeedna waxaan ku soo noqday Dimishaq.
18 Kolkaasaan saddex sannadood dabadeed Yeruusaalem
aaday inaan Keeyfas soo barto, oo shan iyo toban maalmood
ayaan la joogay isagii. 19 Laakiin rasuulladii kale midna
kama arag, Yacquub oo ah Sayidka walaalkiis mooyaane.
20 Waxan aan idiin soo qorayo, Ilaah hortiis, been ka sheegi
maayo. 21 Markaas dabadeed waxaan imid xagga dalalka
Suuriya iyo Kilikiya, 22 oo weliba laygama weji garanayn
kiniisadaha Masiixa oo Yahuudiya ku yiil. 23 Laakiin waxay
maqleen oo keliya in la yidhi, Kii mar ina silcin jiray, hadda
wuxuu wax ku wacdiyayaa iimaankii uu mar kharribi jiray. 24
Oo Ilaah bay u ammaaneen daraadday.

2 Afar iyo toban sannadood dabadeed ayaan mar kale
Yeruusaalem aaday, Barnabasna wuu ila jiray, oo Tiitosna
waan kaxaystay. 2 Sidii la iigu muujiyey ayaan u tegey, oo
waxaan iyaga hor dhigay injiilka aan dadka aan Yuhuudda
ahayn ku wacdiyo, laakiinse waxaan gooni ahaan u tusay
kuwii sharafta lahaa, si aanan u ahaan mid waxtarla'aan iska
ordaya ama hore u orday. 3 Laakiin xataa Tiitos oo ila socday,
isagoo Gariig ah, laguma qasbin in la gudo 4 walaalaha
beenta ah oo qarsoodiga lanoogu soo geliyey daraaddood,
kuwa noogu soo galay inay basaasaan xorriyaddeenna
aynu Ciise Masiix ku haysanno, inay na addoonsadaan. 5
In runta injiilku idinla sii jirto, taas daraaddeed ayaannan
saacad qudha u hoos gelin iyaga. 6 Laakiinse kuwii loo
maleeyey inay sharaf leeyihiin (wax kastoo ay ahaayeen,
waxba igama gelin; waayo, Ilaah dadka wejigiisa uma kala
eexdo) waxaan leeyahay, Kuwii sharafta lahaa waxba iguma
ay darin. 7 Laakiinse kolkay arkeen in laygu ammaaneeyey
injiilka kuwa buuryoqabka ah, xataa sidii Butros loogu
ammaaneeyey injiilka kuwa gudan, 8 waayo, kii Butros
kaga dhex shaqeeyey sii uu rasuul ugu ahaado kuwa
gudan ayaa anna igaga dhex shaqeeyey sii aan dadka aan
Yuhuudda ahayn rasuul ugu ahaado, 9 oo kolkay ogaadeen
nimcada lay siiyey, Yacquub iyo Keeyfas iyo Yooxanaa,
iyagoo loo sharfay sida tiirar, waxay aniga iyo Barnabas na
siiyeen gacanta midigta oo wehelnimada, inaannu annagu u
tagno dadka aan Yuhuudda ahayn, iyaguna ay u tagaan
kuwa gudan. 10 Waxay keliyahoo doonayeen inaannu
masaakiinta xusuusanno, taas oo aan ku dadaalayay inaan
sameeyo. 11 Laakiinse Keeyfas kolkuu Antiyokh yimid,
waan hor joogsaday, maxaa yeelay, wuu eedaysnaa. 12
Maxaa yeelay, intaan qaar Yacquub ka iman, Keeyfas wuxuu
wax la cuni jiray dad aan Yuhuud ahayn, laakiinse markay
yimaadeen, wuu ka soo noqday oo ka soocmay, isagoo
kuwa gudan ka cabsanaya. 13 Yuhuudda inteedii kalena
sidaas oo kalay labawejiilayaal la ahaayeen isaga, sidaas
daraaddeed labawejiilenimadoodii waxay la tagtay xataa
Barnabas. 14 Kolkaan arkay inayan si hagaagsan ugu
soconayn runta injiilka, ayaan kulli hortooda Keeyfas ku
idhi, Adigoo Yuhuudi ah haddaad u dhaqanto sida dadka
aan Yuhuudda ahayn, oo aadan ahaan sida Yuhuudda,
sidee baad ugu qasbaysaa dadka aan Yuhuudda ahayn
inay u dhaqmaan sida Yuhuudda? 15 Innagoo jinsigeennu

Yuhuud yahay, oo aan ahayn dembilayaal aan Yuhuud
ahayn, 16 ayaynu weliba garanaynaa inaan nin xaq ku
noqon shuqullada sharciga, rumaysadka uu Ciise Masiix
ku rumaystay mooyaane, xataa innagu waan rumaysannay
Ciise Masiix inaynu xaq ku noqonno rumaysadka Masiix ee
ayan ahayn shuqullada sharciga, maxaa yeelay, shuqullada
sharciga ninna xaq kuma noqon doono. 17 Laakiinse
markaynu doonaynay inaynu Masiix xaq ku noqonno, haddii
la helo inaynu qudheennu dembilayaal nahay, Masiix miyuu
yahay midiidinka dembiga? Ma suurtowdo! 18 Waayo,
haddaan mar kale dhiso waxyaalihii aan dumiyey, waxaan
isku caddaynayaa inaan ahay mid xad gudbay. 19 Anigu
sharcigaan ugu dhintay xagga sharciga inaan Ilaah u
noolaado. 20 Waxaa iskutallaabta laygula qodbay Masiixa,
laakiin weli waan noolahay. Aniga ma aha kan nooli, laakiin
Masiix ayaa igu dhex nool, oo nolosha aan haatan jidhka
ku dhex noolahay waxaan ku noolahay rumaysadka xagga
Wiilka Ilaah, kan i jeclaaday oo naftiisa u bixiyey daraadday.
21 Nimcada Ilaah burin maayo, waayo, haddii xaqnimo
sharciga laga helo, Masiix micnela'aan buu u dhintay.

3 Garaadlaawayaasha reer Galatiyow, yaa idin sasabtay,
kuwiinna indhahooda la hor dhigay Ciise Masiix oo
iskutallaabta lagu qodbay? 2 Waxaan keliyahoo idinka
doonayaa inaan idinka barto, Ruuxa ma waxaad ku
hesheen shuqullada sharciga mise maqlidda rumaysadka?
3 Ma sidaasaad u garaadla'dihiin? Idinkoo Ruuxa ku
bilaabay miyaad haatan jidhka ku dhammaynaysaan? 4 Ma
waxtarla'aan baad wax badan ugu xanuunsateen? hadday
waxtarla'aan ahayd. 5 Haddaba kan Ruuxa idin siiya oo
shuqullada xoogga leh idinku dhex sameeyaa, ma wuxuu ku
sameeyaa shuqullada sharciga mise maqlidda rumaysadka?
6 Sidaas oo kalaa Ibraahim Ilaah u rumaystay, oo waxaa
isaga loogu tiriyey xaqnimo. 7 Haddaba ogaada in kuwa
rumaysadka lahu yihiin wiilashii Ibraahim. 8 Qorniinka oo
hore u arkay in Ilaah quruumaha xaq kaga dhigi doono
rumaysad, ayaa injiilka hore ugu sii sheegay Ibraahim
isagoo leh, Quruumaha oo dhammi adigay kugu barakoobi
doonaan. 9 Sidaas daraaddeed kuwa rumaysadka lahu
waxay la barakaysan yihiin Ibraahimkii rumaystay. 10 In
alla intii shuqullada sharciga isku hallaysaa, inkaar bay ku
hoos jiraan; waayo, waxaa qoran, Waa inkaaran yahay ku
kasta oo aan ku sii soconin inuu sameeyo wax kasta oo ku
qoran kitaabka sharciga. 11 Inuusan ninna sharciga xaq
ku noqon Ilaah hortiisa waa bayaan, waayo, Kii xaq ahu
rumaysad buu ku noolaan doonaa. 12 Sharciguna kama
iman rumaysadka, laakiin, Kii sameeya waxyaalaha sharciga
iyaguu ku noolaan doonaa. 13 Masiix wuxuu inaga furtay
inkaartii sharciga, isagoo inkaar inoo noqday, waayo, waxaa
qoran, Mid kasta oo geed ka soo deldelanu wuu inkaaran
yahay, 14 inay barakadii Ibraahim quruumaha ugu timaado
Ciise Masiix; inaynu ballankii Ruuxa ku helno rumaysad.
15 Walaalayaalow, sida dadkaan u hadlayaa, In kastoo ay
tahay xataa axdiga dadka, mar haddii la hubiyo, lama buriyo,
waxbana laguma daro. 16 Ballamada waxaa loo qaaday
Ibraahim iyo kii ka soo farcamay. Lama odhan, Kuwa ka soo
farcamay sida kuwa badan, laakiinse sidii mid keliya, oo
ah kan ka soo farcamay, kaas oo ah Masiixa. 17 Waxaan
leeyahay, Ilaah baa axdi hore u dhigay, oo sharcigii afar boqol
iyo soddon sannadood dabadeed yimid ma buriyo axdigaas
oo ballanka ma baabbi'iyo. 18 Waayo, haddii dhaxalka laga
helo sharciga, ballanka lagama sii heleen; laakiinse Ilaah baa
Ibraahim ballan ku siiyey. 19 Haddaba sharcigu waa maxay?
Waxaa loogu daray xadgudubyo aawadood, ilaa farcankii
loo ballanqaaday yimaado, oo waxaa xagga malaa'igaha
lagaga amray dhexdhexaadiye gacantiis. 20 Dhexdhexaadiye
mid keliyahu ma leh, laakiinse Ilaah waa mid keliya. 21
Haddaba sharcigu miyuu ka gees yahay ballamadii Ilaah?
Ma suurtowdo, waayo, haddii sharci wax noolayn kara laysa
siiyey, sida runta ah, xaqnimada waxaa laga heli lahaa
sharciga. 22 Laakiin Qorniinku wax walba dembiguu ku
hoos xidhay in ballanka rumaysadka ee Ciise Masiix la siiyo
kuwa rumaystay. 23 Laakiinse intaan rumaysadku iman
waxaa laynagu hoos hayay sharciga, innagoo xidhan, ilaa
rumaysadka la muujiyo. 24 Sidaas daraaddeed sharcigu
wuxuu ahaa edbiyeheenna inuu Masiixa inoo geeyo, inaynu
xaq ku noqonno rumaysadka. 25 Laakiinse rumaysadkii
waa yimid, oo taas daraaddeed mar dambe edbiye kama
hoosayno. 26 Waayo, kulligiin waxaad wiilashii Ilaah ku tihiin
rumaysad idinkoo ku jira Ciise Masiix. 27 In alla intiinna
lagu baabtiisay Masiix, waxaad huwateen Masiix. 28 Ma jiro
Yuhuud ama Gariig, ma jiro addoon ama xor, ma jiro lab
ama dhaddig, waayo, kulligiin mid baad ku wada tihiin Ciise
Masiix. 29 Haddaad tihiin Masiixa kuwiisa, waxaad tihiin
Ibraahim farcankiisa oo ah kuwa dhaxalka leh sida ballanku
leeyahay.

4 Laakiin waxaan leeyahay, Inta midka dhaxalka lahu ilmo
yar yahay, waxba kama duwana addoon in kastuu yahay
sayidka wax walba, 2 laakiinse wuxuu ka hooseeyaa kuwa
ilaaliya iyo wakiillo ilaa maalintii aabbihiis ka ballamay. 3
Sidaas oo kale innagu markaynu carruur ahayn, waxaa
ina addoonsan jiray waxyaalaha aasaaska ah ee dunida;
4 laakiinse markii wakhtigii buuxsamay, Ilaah wuxuu soo

diray Wiilkiisii, isagoo naag ka dhashay oo sharciga
ku hoos dhashay, 5 inuu furto kuwii sharciga ku hoos
jiray inuu carruurtiis inaga dhigo. 6 Oo wiilashiisa aad
tihiin daraaddeed ayaa Ilaah u soo diray Ruuxa Wiilkiisa
qalbiyadeenna dhexdooda, isagoo dhawaaqaya oo leh,
Aabbow. 7 Saasaadan mar dambe addoon u ahayn, laakiinse
waxaad tahay wiilkiisa, oo haddaad wiilkiisa tahay, waxaadna
tahay mid dhaxal leh xagga Ilaah. 8 Laakiinse markii aydnaan
Ilaah garanayn, waxaad addoommo u ahaydeen kuwo aan
ilaahyo ahayn xagga dabiicadda. 9 Laakiin haatan idinkoo
Ilaah gartay ama Ilaah idin gartay, sidee baad mar kale
ugu noqotaan waxyaalaha aasaaska oo miskiinnimada
ah, tabartana daran, kuwa aad jeceshihiin inaad mar kale
addoommo u noqotaan? 10 Waxaad dhawrtaan maalmo,
iyo bilo, iyo xilliyo, iyo sannado. 11 Waxaan ka baqayaa
inaan waxtarla'aan idinkugu hawshooday. 12 Waxaan idinka
baryayaa, walaalayaalow, inaad noqotaan sida aan ahay,
waayo, anba waxaan ahay sida aad tihiin. Waxba iguma
aydnaan xumayn. 13 Laakiin waad og tihiin in itaaldarrada
jidhka aawadeed aan markii ugu horraysay injiilka idinku
wacdiyey. 14 Waxa ku saabsan jidhkayga oo idin jirrabay ma
aydnaan quudhsan, mana aydnaan nicin, laakiin waxaad
ii aqbasheen sidii malaa'ig Ilaah, xataa sidii Ciise Masiix.
15 Haddaba meeday farxaddiinnii? Waayo, waxaan idiinku
markhaati furayaa inaad ii bixin lahaydeen indhihiinna
oo aad i siin lahaydeen, hadday suurtowbi lahayd. 16
Haddaba cadowgiinnii miyaan noqday runta aan idiin sheego
aawadeed? 17 Aad bay idinku doondoonayaan si aan
wanaagsanayn, laakiin waxay doonaan inay idinka kaayo
xidhaan, si aad idinku iyaga u doondoontaan. 18 Waa
wanaagsan tahay in aad loo doondoono wixii wanaagsan
had iyo goorba, oo ayan ahayn markaan idinla joogo oo
keliya. 19 Carruurtaydiiyey, mar kalaan idin foolanayaa
ilaa Masiix idinku dhex abuurmo. 20 Waxaan jeclaan
lahaa inaan haatan idinla joogo oo aan codkayga beddelo,
waayo, waan idinka shakiyayaa. 21 Kuwiinna doonaya inay
sharciga ka hooseeyaanow, ii sheega. Sharciga miyeydnaan
maqlin? 22 Waayo, waxaa qoran in Ibraahim laba wiil
lahaa, kii uu addoonta ka dhalay iyo kii uu naagta xorta
ah ka dhalay. 23 Laakiin kii addoontu xagga jidhkuu ka
dhashay, naagta xorta ah keediise ballan buu ku dhashay.
24 Waxyaalahanu waa masaal, waayo, dumarkanu waxay
ka dhigan yihiin laba axdi, mid Buur Siinay buu ka yimid
isagoo u dhalaya addoonnimo, taasu waa Haagaar. 25
Haagaartanu waa Buur Siinay oo Carabiya ku taal, oo waxay
ka dhigan tahay Yeruusaalemta haatan joogta; waayo, waa
la addoonsaday iyada iyo carruurteedaba. 26 Laakiinse
Yeruusaalemta sare waa xor, waana hooyadeen. 27 Waayo,
waxaa qoran, Faraxsanow, madhalaysta aan dhalinay;
Kala bax oo mashxarad, taada aan foolanay; Waayo, tan
cidlowday carruurteedu waa ka badan yihiin tan ninka leh
kuweeda. 28 Innaguna, walaalayaalow, waxaynu nahay
carruurtii ballanka sida Isxaaq oo kale. 29 Laakiin markaas
kii jidhka ka dhashay wuxuu silciyey kii Ruuxa ka dhashay,
haatanna waa sidaas oo kale. 30 Laakiin maxaa Qorniinku
leeyahay? Addoonta iyo wiilkeedaba eri, waayo, wiilka
addoontu dhaxal la wadaagi maayo wiilka naagta xorta
ah. 31 Sidaas daraaddeed, walaalayaalow, innagu ma nihin
addoon carruurteed, laakiinse waxaynu nahay naagta xorta
ah carruurteed.

5 Xorriyad ayuu Masiixu inagu xoreeyey. Haddaba
adkaada, oo mar dambe yaan laydinku qaban harqoodka
addoonnimada. 2 Bal ogaada, aniga oo Bawlos ah waxaan
idinku leeyahay, Haddii laydin gudo, Masiixu waxba idiin
tari maayo. 3 Waxaan haddana ugu markhaati furayaa,
nin kasta oo la gudo, waxaa ku waajib ah inuu sharciga
oo dhan sameeyo. 4 Waad ka soocan tihiin Masiixa,
kuwiinna sharciga xaq ku noqon lahaayow; nimcadiina waad
ka dhacdeen. 5 Waayo, innagu xagga Ruuxa waxaynu
rumaysad ku sugnaa rajada xaqnimada. 6 Maxaa yeelay,
xagga Ciise Masiix gudniinta iyo buuryoqabnimada midna
wax ma tarto, laakiinse waxaa wax tara rumaysadka ku
shaqeeya jacayl. 7 Si wanaagsan baad u ordayseen, ee
yaa idinka hor joogsaday inaydnaan runta addeecin? 8
Taladanu kama iman kan idiin yeedhaya. 9 In yar oo khamiir
ah cajiinka oo dhan bay khamiirisaa. 10 Xagga Rabbiga
waan idin hubaa inaydnaan wax kale ka fikirayn, laakiin
kii idin dhibaa, xukunkiisuu qaadan doonaa mid kastuu
yahayba. 11 Laakiin, walaalayaalow, haddii aan anigu weli
gudniinta wax ku wacdiyo, maxaa weli la ii silciyaa? Haddaba
xumaan-u-qaadashada iskutallaabtu waa dhammaatay.
12 Waxaan jeclaan lahaa in kuwa idin wareeriyaa ay
isgooyaan. 13 Waayo, walaalayaalow, waxaa laydiinku
yeedhay xorriyad, laakiin xorriyaddiinna jidhka marmarsiinyo
ha uga dhigina, laakiin midkiinba midka kale kalgacayl ha
ugu adeego. 14 Waayo, sharciga oo dhammu hadal keliya
buu ku dhammaaday, waana kan, Waa inaad deriskaaga u
jeclaataa sidaad naftaada u jeceshahay. 15 Laakiin haddaad
isqaniintaan oo iscuntaan, iska dhawra yeydnan isbaabbi'in.
16 Laakiin waxaan leeyahay, Ruuxa ku socda, kolkaas
aydnaan damaca jidhka yeelayne. 17 Waayo, damaca
jidhku waa ka gees Ruuxa, Ruuxuna waa ka gees jidhka,
maxaa yeelay, kuwanu waa kala gees, si aydnaan u samayn

waxyaalahaad doonaysaan. 18 Laakiinse haddii Ruuxu idin
hoggaamiyo, sharciga kuma hoos jirtaan. 19 Shuqullada
jidhku waa muuqdaan, waana kuwan, sino, wasakhnimo,
dhillanimo, 20 sanamcaabudid, sixirnimo, cadownimo, dirir,
masayr, xanaaq, is-ilaaq, iskala qaybqaybin, bidcinimo, 21
xaasidnimo, sakhraannimo, rabshooyin iyo waxyaalo la mid
ah. Kuwaas waan idiinka digayaa, sidaan markii horeba
idiinku sheegay, in kuwa waxyaalaha caynkaas ah sameeyaa
ayan dhaxli doonin boqortooyada Ilaah. 22 Laakiin midhaha
Ruuxu waa jacayl, farxad, nabad, dulqaadasho, roonaan,
wanaag, aaminnimo, 23 qabownimo, iscelin; waxa caynkaas
ah sharci ka gees ahu ma jiro. 24 Kuwa Ciise Masiix waxay
iskutallaabta ku qodbeen jidhka iyo kacsigiisa xaaraanta ah
iyo damacyadiisa sharka ah. 25 Haddii aynu Ruuxa ku nool
nahay, aynu Ruuxana ku soconno. 26 Yeynan iskibrin, oo
iska xanaajin, oo isxaasidin.

**6** Walaalayaalow, nin haddii xadgudub lagu qabto, kuwiinna
Ruuxa raaca midka caynkaas ah ku soo celiya qabow,
adigoo isdhawraya si aan adna laguu jirrabin. 2 Midba
midka kale culaabta ha u qaado, oo sidaas ku oofiya
sharciga Masiixa. 3 Haddii nin isu maleeyo inuu weyn
yahay isagoo aan waxba ku fillayn, wuu iskhiyaaneeyaa.
4 Laakiin nin kastaa shuqulkiisa ha tijaabiyo, dabadeedna
faan ayuu iska heli doonaa oo ku kale kama heli doono. 5
Waayo, nin kastaaba waa inuu culaabtiisa qaato. 6 Kan
hadalka la baraa wax walba oo wanaagsan qayb ha ka
siiyo kan wax bara. 7 Yaan laydin khiyaanayn; Ilaah laguma
majaajiloodo, waayo, nin kastaa wax alla wuxuu beerto
ayuu goosan doonaa. 8 Waayo, kii jidhkiisa wax ku beertaa
wuxuu jidhka ka goosan doonaa qudhun, laakiin kii Ruuxa
wax ku beertaa, wuxuu Ruuxa ka goosan doonaa nolol
weligeed ah. **(aiōnios g166)** 9 Oo wanaagfalidda yeynan ka
daalin, waayo, wakhtigeeda ayaynu wax ka goosan doonnaa
haddaynan ka qalbi jabin. 10 Sidaas daraaddeed markaynu
wakhtiga haysanno, kulli aan wanaag u samayno, khusuusan
dadka rumaysadka leh. 11 Bal eega xuruufta waaweyn oo
aan gacantayda idiinku soo qoray. 12 Kuwa doonaya inay
dadka istusaan inay wanaagsan yihiin xagga jidhka waxay
keliyahoo idinku qasbaan in laydin gudo, inaan iskutallaabta
Masiixa aawadeed loo silcin iyaga. 13 Xataa kuwa gudanu
sharciga ma xajiyaan, laakiin waxay u doonayaan in laydin
gudo inay jidhkiinna ku faanaan. 14 Laakiinse yaanay noqon
inaan wax kale ku faano iskutallaabta Rabbigeenna Ciise
Masiix mooyaane, tan dunidu iigu musmaarantay, anna
aan dunida ugu musmaarmay. 15 Waayo, gudniinta iyo
buuryoqabnimada midna waxba ma tarto, laakiinse waxaa
wax tara abuurid cusub. 16 In alla intii qaynuunkan ku socota,
iyo Israa'iilka Ilaahba, nabad iyo naxariisuba dushooda ha
ahaadeen. 17 Hadda dabadeed ninna yuu i dhibin, waayo,
waxaa jidhkayga ku yaal sumadihii Ciise. 18 Walaalayaalow,
nimcada Rabbigeenna Ciise Masiix ruuxiinna ha la jirto.
Aamiin.

# Efesos

1 Anigoo Bawlos ah, oo rasuul u ah Ciise Masiix xagga
doonista Ilaah, waxaan warqaddan u qorayaa quduusiinta
Efesos joogta iyo kuwa aaminka ah oo Ciise Masiix ku
jira. 2 Nimco ha idinla jirto iyo nabad ka timaada Ilaaha
Aabbeheenna ah iyo Rabbi Ciise Masiix. 3 Ammaanu ha u
ahaato Ilaaha ah Aabbaha Rabbigeenna Ciise Masiix. Wuxuu
Masiix inagu siiyey barako kasta oo Ruuxa ka timid ee ku
jirta meelaha jannada, 4 xataa siduu inoogu doortay isaga
dhexdiisa intaan dunida la aasaasin ka hor inaynu quduus
ahaanno oo iin la'aanno isaga hortiisa, isagoo ina jecel, 5 oo
hore inoogu doortay inuu inaga dhigto carruurtiisii xagga Ciise
Masiix siduu doonayay oo ku farxay, 6 in la ammaano cisada
nimcadiisa ee uu inagu siiyey kan uu jecel yahay. 7 Isaga,
sida ay hodantinimada nimcadiisu tahay, waxaynu dhiiggiisa
ku leennahay madaxfurasho ah dembidhaafkeenna. 8
Nimcadaas wuxuu inoogu badiyey xagga xigmadda iyo
miyirka oo dhan, 9 oo wuxuu ina ogeysiiyey qarsoodiga
doonistiisa siduu ugu farxay oo Masiixa ugu fikiray 10 oo ugu
talaggalay dhammaadka wakhtiga inuu Masiixa ku ururiyo
wax kasta, waxa samooyinka ku jira iyo waxa dhulka joogaba.
11 Isagaynu dhaxal ku helnay innagoo laynagu doortay
qasdiga kan wax kasta kaga shaqeeya sida ay tahay talada
doonistiisu, 12 in kuweenna markii hore Masiixa wax ku
rajeeyey aynu ahaanno kuwo aawadood lagu ammaano Ilaah
cisadiisa. 13 Oo weliba idinku isagaad ku maqasheen ereyga
runta ah, kaas oo ah injiilka badbaadadiinna, oo weliba
idinku markii aad rumaysateen ayaa laydinku shaabadeeyey
Ruuxa Quduuska ah oo uu ballanqaaday, 14 oo ah carbuuntii
dhaxalkeenna xagga furashada hantida Ilaah in la ammaano
cisadiisa. 15 Anigu waxaan maqlay rumaysadkiinna xagga
Rabbi Ciise, iyo jacaylka aad quduusiinta oo dhan u qabtaan,
oo sidaas daraaddeed 16 ma joojiyo inaan Ilaah idiinku
mahadnaqo. Baryadayda ayaan idinku soo xusuusanayaa,
17 in Ilaaha Rabbigeenna Ciise Masiix oo ah Aabbaha
ammaanta uu ruuxa xigmadda iyo muujinta idinku siiyo
aqoonta aad isaga taqaaniin. 18 Oo waxaan Ilaah baryayaa
in indhaha qalbigiinna la nuuriyo, si aad u ogaataan waxa ay
tahay rajada yeedhistiisu, iyo waxa ay tahay hodantinimada
ammaanta dhaxalkiisa ee ku jirta quduusiinta, 19 iyo waxa ay
tahay weynaanta xooggiisa aan la koobi karin oo uu u hayo
kuweenna rumaysan, sida uu u shaqeeyo xoogga itaalkiisa
20 ee uu kaga shaqeeyey Masiixii, goortuu kuwii dhintay
ka soo sara kiciyey, oo uu fadhiisiyey meelaha jannada
xagga midigtiisa. 21 Oo wuxuu isaga ka sarreeysiiyey madax
kasta, iyo amar kasta, iyo xoog kasta, iyo sayidnimo kasta,
iyo magac kasta oo la magacaabay, mana aha wakhtigan
oo keliya, laakiinse xataa kan imanaya. (aiōn g165) 22 Wax
kastana wuxuu ka hoosaysiiyey cagihiisa, oo wuxuu isaga
madax wax kasta ka sarreeyaa uga dhigay kiniisadda, 23
taas oo ah jidhkiisa oo ah buuxidda kan wax kasta meel
walba ku buuxiya.

2 Idinku waxaad ku dhimateen xadgudubyadiinna iyo
dembiyadiinna, 2 kuwaas oo aad markii hore ugu
socon jirteen sida socodka wakhtigan iyo sida madaxda
xoogga hawada oo ah ruuxa haatan ka dhex shaqaynaya
carruurta caasinimada. (aiōn g165) 3 Iyaga dhexdooda
mar baynu dhammaanteen ku dhaqmi jirnay damacyada
jidhkeenna, innagoo samaynayna waxyaalaha jidhka iyo
maanku ay doonayaan, oo innaguna xagga dabiicadda
waxaynu ka ahayn carruurtii cadhada sida dadka kale. 4
Laakiinse Ilaaha naxariista hodanka ka ahu wuxuu inagu
jeclaaday jacaylkiisa weyn, 5 oo sidaas daraaddeed markii
aynu xadgudubyadeenna ku dhimannay wuxuu inala soo
noolaysiiyey Masiix. Idinku nimco baad ku badbaaddeen. 6
Oo innagana isagii buu inala soo sara kiciyey, oo wuxuu isagii
inala fadhiisiyey meelaha jannada xagga Ciise Masiix, 7 si
uu wakhtiyada imanaya hodantinimada weyn oo nimcadiisa
ugu muujiyo roonaanta uu inoogu qabo xagga Ciise Masiix.
(aiōn g165) 8 Waayo, idinku waxaad ku badbaaddeen nimco
xagga rumaysadka, mana aha wax xaggiinna ka yimid, 9
laakiinse waa hadiyadda Ilaah, mana aha xagga shuqullada,
si aan ninna ugu faanin. 10 Waayo, innagu waxaynu
nahay wixii uu sameeyey, oo waxaa laynoogu uumay Ciise
Masiix shuqullada wanaagsan aawadood oo Ilaah hore
ugu diyaariyey inaynu ku soconno. 11 Haddaba sidaas
daraaddeed idinku xusuusta inaad waa hore xagga jidhka ka
ahaan jirteen dad aan Yuhuud ahayn, oo kuwa gudan la
yidhaahdo oo xagga jidhka gacmo lagu guday ay idiinku
yeedhi jireen buuryoqab. 12 Waagaas Masiix baad ka
soocnaydeen, oo shisheeyaad ka ahaydeen dawladda reer
binu Israa'iil, oo ajanabi baad ka ahaydeen axdiyada ballanka,
idinkoo aan rajo lahayn, oo aan dunida Ilaah ku lahayn.
13 Laakiinse kuwiinna mar hore fogaa, haatan waxaad ku
jirtaan Ciise Masiix, oo waxaa laydinku soo dhoweeyey
dhiigga Masiixa. 14 Waayo, isagu waa nabaddeenna, oo
waa kan labada mid ka dhigay, oo dumiyey qoqobkii derbiga
dhexe, 15 isagoo jidhkiisii ku buriyey cadownimadii taas
oo ah sharciga amarrada ku jira qaynuunnada, inuu isaga
qudhiisu labadii isugu abuuro nin cusub, isagoo saas nabad
ku samaynaya, 16 iyo inuu labadooda oo isku jidh ah Ilaah
kula heshiisiiyo xagga iskutallaabta, isagoo halkaas ku dilay

cadownimada. 17 Oo markuu yimid ayuu nabad ku wacdiyey
kuwiinnii fogaa, oo kuwii dhowaana nabad buu ku wacdiyey,
18 waayo, labadeennaba isagaynu Ruux keliya ugu galnaa
Aabbaha. 19 Sidaas daraaddeed idinku mar dambe ma
ihidin ajanabiyo iyo shisheeyayaal, laakiinse quduusiintaad
isku waddan tihiin, oo waxaad ka mid tihiin reerka Ilaah,
20 oo waxaa laydinka dul dhisay aasaaskii rasuullada iyo
nebiyada, oo waxaa dhagaxii geeska ee ugu weynaa idiin
ah Ciise Masiix qudhiisa. 21 Oo dhismaha oo dhammu
isaguu si wanaagsan isugu haystaa oo weynaadaa, oo
wuxuu Rabbiga u noqdaa macbud quduus ah. 22 Idinkana
isagaa laydinku wada dhisay inaad ahaataan rugtii Ilaah
xagga Ruuxa.

**3** Sababtaas daraaddeed anigoo Bawlos ah waxaan Ciise
Masiix maxbuus ugu ahay idinka oo ah dad aan Yuhuud
ahayn aawadiin. 2 Hubaal waxaad maqasheen wakiilnimada
nimcada Ilaah oo la iigu kiin dhiibay, 3 iyo sida qarsoodigii
laygu ogeysiiyey wixii la ii muujiyey, sidii aan mar hore dhawr
eray idiinku soo qoray. 4 Markaad akhridaan waxaad ogaan
karaysaan garashadayda xagga qarsoodiga Masiixa, 5 kaas
oo aan qarniyadii kale loogu ogeysiin bini aadmiga sida
haatan Ruuxu ugu muujiyey rasuulladiisa iyo nebiyadiisa
quduuska ah. 6 Taas waxaa weeyaan in haatan dadka aan
Yuhuudda ahayn ay yihiin kuwo wax inala dhaxla, oo aan
isku jidh nahay, oo ay inagula qayb qaataan ballankii Ciise
Masiix xagga injiilka, 7 kaas oo aniga layga dhigay midiidin
sida ay tahay hadiyadda nimcada Ilaah oo lay siiyey sida
ay tahay shaqaynta xooggiisu. 8 Aniga oo quduusiinta oo
dhan ugu liita waxaa nimcadan la ii siiyey inaan dadka aan
Yuhuudda ahayn ku wacdiyo hodantinimada Masiixa oo aan
la baadhi karin, 9 iyo inaan dadka oo dhan garansiiyo waxay
tahay talogelidda qarsoodigii weligiis ku qarsoonaa Ilaaha ah
kan wax walba abuuray. **(aiōn g165)** 10 Sababtuna waxaa
weeyaan in haatan madaxda iyo kuwa amarka leh oo ku jira
meelaha jannada, kiniisadda lagu ogeysiiyo xigmadda Ilaah
oo badan oo kala cayncaynka ah, 11 sida uu yahay qasdiga
weligiis ah oo isagu ku qasdiyey Rabbigeenna Ciise Masiix,
**(aiōn g165)** 12 kaas oo aynu ku leennahay dhiirranaan, oo
aynu iskuhallayn ugu geli karno xagga rumaysadka aynu
isaga rumaysan nahay. 13 Sidaas daraaddeed waxaan
idinka baryayaa inaydnaan ku qalbi jabin dhibaatooyinkayga
aan daraaddiin u maray, waayo, taasu waa idiin ammaan.
14 Sababtaas daraaddeed waxaan ugu jilba joogsadaa
Aabbaha hortiisa, 15 kaas oo magiciisa lagu magacaabay
reerka oo dhan inta jannada ku jirta iyo inta dhulka joogtaba,
16 in sida hodantinimada ammaantiisu ay tahay uu idin siiyo
itaal aad Ruuxiisa kaga xoogaysataan xagga gudihiinna, 17
iyo in Masiixu qalbiyadiinna degganaado xagga rumaysadka,
18 inaad jacayl xidid iyo aasaas ku yeelataan, iyo inaad
u xoogaysataan si aad quduusiinta oo dhan ula garataan
waxa ay yihiin ballaadhka iyo dhererka iyo korudheerida iyo
hoosudheerida, 19 iyo inaad ogaataan jacaylka Masiixa oo
aqoonta dhaafa, si ay idiinka buuxsanto Ilaah buuxnaantiisa
oo dhammu. 20 Haddaba kan awooda inuu inoo sameeyo
wax aad iyo aad uga sii badan waxa aynu weyddiisanno
ama ku fikirno oo dhan sida u yahay xoogga inaga dhex
shaqeeya, 21 isaga ammaanu ha ugu ahaato kiniisadda iyo
Ciise Masiixba tan iyo qarniyada oo dhan iyo weligiis iyo
weligiisba. Aamiin. **(aiōn g165)**

**4** Haddaba sidaas daraaddeed anigoo maxbuus ku ah
Rabbiga, waxaan idinka baryayaa inaad yeedhistii
laydiinku yeedhay ugu socotaan si istaahil ah, 2 idinkoo
leh is-hoosaysiin iyo qalbiqaboobaan oo dhan iyo samir, oo
midkiinba midka kale jacayl ugu dulqaadanayo. 3 Ku dadaala
inaad midownimada xagga Ruuxa ku xajisaan xidhiidhka
nabadda. 4 Haddaba waxaa jira jidh keliya iyo Ruux keliya,
xataa sida idinka laydiinkugu yeedhay rajo keliya xagga
yeedhistiinnii. 5 Oo waxaa jira Rabbi keliya iyo iimaan keliya
iyo baabtiis keliya, 6 iyo Ilaah keliya oo kulli Aabbe u ah, oo
wax walba ka sarreeya, oo wax walba ka dhex shaqeeya, oo
wax walba ku jira. 7 Laakiinse midkeen kastaba nimcada
waxaa laynoo siiyey sida ay tahay qiyaasta hadiyadda
Masiixa. 8 Sidaas daraaddeed wuxuu yidhi, Markuu kor u
baxay ayuu wuxuu qabtay oo kaxeeyey kuwii maxaabiista
ahaan jiray, Wuxuuna dadka siiyey hadiyado. 9 Haddaba,
kor buu u baxay, micneheedu waa maxay haddayan ahayn
inuu isagu hoos ugu degtay meelaha dhulka ugu hooseeya?
10 Waa isla kii hoos u degtay kan haddana kor u baxay oo
samooyinka oo dhan ka sara maray si uu isaga buuxiyo
wax kastaba. 11 Oo qaar wuxuu ka dhigay inay ahaadaan
rasuullo, qaarna nebiyo, qaarna wacdiyayaal, qaarna kuwo
kiniisadda dhaqaaleeya, iyo macallimiin. 12 Sababtuna
waa kaamilidda quduusiinta xagga shuqulka adeegidda,
iyo xagga dhisidda jidhka Masiixa, 13 ilaa aynu wada
gaadhno midnimada rumaysadka iyo aqoonta Wiilka Ilaah
oo aynu noqonno dad waaweyn xagga qiyaasta koridda
ee buuxnaanta Masiixa. 14 Waa inaynaan mar dambe
ahaan carruur rogrogmanaysa oo lagu kaxaysto dabayl
kasta oo cilmi ah xagga dulanka dadka iyo khiyaanada
iyo sirta qaladka. 15 Laakiinse innagoo si jacayl ah runta
ugu hadlayna aynu wax walba ku korno xaggiisa, kan
madaxa ah oo ah Masiixa, 16 kaas oo jidhka oo dhammu

si wanaagsan isugu haysto oo isugu wada xidhan yahay
caawimaadda xubin kastaaba keento sida xubin kastaaba u
shaqayso qiyaasteeda oo ugu kordhiso jidhka inuu jacayl
ku dhismo. 17 Haddaba sidaas daraaddeed Rabbiga waan
idiinkugu markhaati furayaa, oo waxaan idinku leeyahay,
Mar dambe ha ugu soconina sida dad aan Ilaah aaminin ugu
socdaan xumaanta maankooda. 18 Waxgarashadoodii way
madoobaatay, oo jaahilnimada iyaga ku jirta aawadeed iyo
qalbi engegnaantooda aawadeed ayay ajanabi uga noqdeen
nolosha Ilaah. 19 Iyagoo xishood beelay waxay isu daayeen
nijaas inay wasakh kasta hunguriweynaan ku sameeyaan.
20 Laakiinse idinku Masiixa sidaas kuma aydnaan baran, 21
hadday run tahay inaad isaga maqasheen oo isaga laydinku
baray sida runtu Ciise ugu jirto. 22 Waa inaad iska xoortaan
dabiicaddii hore, oo ku saabsanayd socodkiinnii aad ku socon
jirteen, taas oo kharribanta xagga damacyada khiyaanada;
23 oo waa inaad ku cusboonaataan ruuxa maankiinna, 24
oo aad huwataan dabiicadda cusub oo loo abuuray inay
Ilaah ugu ekaato xaqnimada iyo quduusnimada runta. 25
Sidaas daraaddeed beenta iska fogeeya, oo midkiin waluba
deriskiisa run ha kula hadlo, waayo, innaga midkeenba midka
kale wuxuu u yahay xubnihiisa. 26 Haddaad cadhootaan, ha
dembaabina. Qorraxdu yay idinka dhicin idinkoo cadhaysan.
27 Ibliiskana meel ha siinina. 28 Kii wax xadi jiray yuusan
mar dambe wax xadin, laakiinse ha hawshoodo isagoo
gacmihiisa ku shaqaynaya oo wax wanaagsan samaynaya si
uu u haysto wax uu siiyo ka wax u baahan. 29 Hadal qudhun
ahu yuusan afkiinna ka soo bixin, laakiinse ku hadla waxa u
wanaagsan dhisidda loo baahan yahay inay nimceeyaan
kuwa maqla. 30 Ha calool xumaynina Ruuxa Quduuska ah oo
Ilaah oo laydiinku shaababadeeyey maalinta madaxfurashada.
31 Haddaba qadhaadh iyo dhirif iyo cadho iyo qaylo iyo cay
oo dhammi ha idinka fogaadeen iyo xumaan kastaaba; 32
oo idinka midkiinba midka kale ha u roonaado, oo ha u qalbi
jilicsanaado, idinkoo iscafiyaya sidii Ilaahba Masiixa idiinku
cafiyey.

5 Haddaba ahaada kuwo ku dayda Ilaah idinkoo ah sida
carruur la jecel yahay. 2 Jacayl ku socda siduu Masiixuba
idiin jeclaa, oo uu nafsaddiisii inoogu bixiyey inuu Ilaah u
ahaado qurbaan iyo allabari oo uu ahaado caraf udgoon.
3 Laakiinse sida ay quduusiinta ugu eg tahay, marnaba
yaan dhexdiinna laga sheegin sino, iyo wasakh oo dhan,
iyo damacnimo, 4 iyo ceeb, iyo hadal nacasnimo ah, iyo
kaftan bilaash ah, oo aan idinku habboonayn, laakiinse
waxaa idinku wacan mahadnaqid. 5 Waayo, taas waad
taqaaniin in dhillay, ama qof wasakh ah, ama nin damac
xun oo sanam caabudaa, uusan innaba dhaxal ku lahayn
boqortooyada Masiix iyo Ilaah. 6 Ninnaba yuusan idinku
khiyaanayn hadal aan micne lahayn; waayo, waxyaalahaas
daraaddood ayaa cadhada Ilaah ugu soo degtaa carruurta
caasinimada. 7 Sidaas daraaddeed ha ahaanina kuwa iyaga
waxyaalahaas la qaybsada; waayo, mar baad ahaydeen
gudcur, 8 haatanse waxaad Rabbiga ku tihiin nuur; haddaba
u socda sida carruurta nuurka, 9 waayo, midhaha nuurku
waxay ku wada jiraan wanaag iyo xaqnimo iyo run oo
dhan. 10 Tijaabiya waxa Rabbigu aad ugu farxo, 11 oo
innaba xidhiidh ha la yeelanina shuqullada aan midhaha
lahayn oo gudcurka, laakiinse kashifa; 12 waayo, waxay
qarsoodiga ku sameeyaan waa ceeb xataa in laga hadlo. 13
Laakiinse wax kastaba markii la kashifo ayaa lagu muujiyaa
nuurka; waayo, wax alla wixii la muujiyaaba waa nuur.
14 Sidaas daraaddeed isagu wuxuu yidhi, Kaaga hurdow
toos, oo kuwii dhintay ka kac, oo Masiixuna waa ku iftiimin
doonaa. 15 Haddaba ka digtoonaada sidaad u socotaan,
oo ha u soconina sida kuwo aan caqli lahayn, laakiinse
u socda sida kuwo caqli leh. 16 Wakhtiga ka faa'iidaysta,
maxaa yeelay, maalmuhu shar bay leeyihiin. 17 Sidaas
daraaddeed nacasyo ha ahaanina, laakiinse garta waxa ay
doonista Rabbigu tahay. 18 Ha ku sakhraamina khamriga
rabshadu ku jirto, laakiinse Ruuxu ha idinka buuxsamo. 19
Iskula hadla sabuurro iyo heeso ammaan ah iyo gabayo
xagga ruuxa, idinkoo gabyaya oo Rabbiga qalbigiinna ka
ammaanaya. 20 Mar kasta Ilaaha Aabbaha ah wax walba
mahad ugu naqa magaca Rabbigeenna Ciise Masiix. 21
Midkiinba midka kale ha iska hoosaysiiyo idinkoo Masiixa ka
cabsanaya. 22 Dumar yahow, nimankiinna ka dambeeya
sidaad Rabbiga uga dambaysaan. 23 Waayo, ninku waa
madaxa afada sida Masiixuba u yahay madaxa kiniisadda
isagoo ah badbaadiyaha jidhka. 24 Laakiinse sida kiniisaddu
uga dambayso Masiixa, afooyinkuna ha uga dambeeyeen
nimankooda xagga wax kastaba. 25 Nimankow, idinkuna
afooyinkiinna u jeclaada siduu Masiixuba u jeclaaday
kiniisadda oo uu nafsaddiisii u bixiyey iyada aawadeed, 26
inuu quduus ka dhigo oo ku nadiifiyo maydhidda biyaha
xagga erayga, 27 si uu kiniisadda isugu keeno iyadoo qurux
badan, oo aan lahayn ama bar ama duudduub ama wax
la mid ah, laakiinse inay ahaato mid quduus ah oo aan
iin lahayn. 28 Haddaba sidaas oo kale nimanka waxaa ku
waajib ah inay afooyinkooda u jeclaadaan sida jidhkooda
oo kale. Waayo, kii afadiisa jeclaadaa wuxuu jeclaadaa
nafsaddiisa; 29 maxaa yeelay, ninna weligiis ma nebcaan
jidhkiisa, laakiinse wuu quudiyaa, wuuna xannaaneeyaa,
sida Masiixuba u xannaaneeyo kiniisadda; 30 waayo, innagu

waxaynu nahay xubnihii jidhkiisa. 31 Oo sababtaas aawadeed
nin wuxuu ka tegayaa aabbihiis iyo hooyadiis, wuxuuna la
joogayaa naagtiisa, oo labaduba waxay noqonayaan isku
jidh. 32 Qarsoodiganu waa weyn yahay, laakiinse waxaan ka
hadlayaa Masiixa iyo kiniisadda. 33 Habase yeeshee idinka
midkiin waluba afadiisa ha u jeclaado sida naftiisa oo kale,
oo afaduna ninkeeda ha maamuusto.

6 Carruurtay, waalidkiinna ku addeeca xagga Rabbiga,
waayo, taasu waa qumman tahay. 2 Qaynuunkii kowaad
oo ballan la jiraa waa kan, Aabbahaa iyo hooyadaa maamuus
3 inaad nabdoonaatid oo cimrigaagu ku dheeraado dhulka. 4
Aabbayaashow, carruurtiinna ha ka cadhaysiinina, laakiinse
waxaad ku korisaan edbinta iyo waanada Rabbiga. 5
Addoommadow, kuwa xagga jidhka sayidyadiinna ah ku
addeeca cabsi iyo gariir iyo qalbi daacad ah sidaad Masiixa
uga cabsataan oo kale. 6 Ha ahaanina kuwo markii loo jeedo
oo keliya shaqeeya sida kuwa dadka ka farxiya, laakiinse
ahaada sida addoommada Masiixa, idinkoo doonista Ilaah
xagga qalbiga ka samaynaya. 7 Niyo wanaagsan ku adeega
sida idinkoo Rabbiga u adeegaya oo aan dad u adeegin, 8
idinkoo garanaya wax kasta oo wanaagsan oo mid kasta
sameeyo inuu Rabbiga isla waxaas ka helayo hadduu yahay
addoon iyo hadduu yahay xorba. 9 Sayidyadow, idinkuna
isla waxaas iyaga u sameeya, oo cabsiinta iska daaya,
waayo, waad og tihiin inuu kan ah Sayidkooda iyo kiinnaba
jannada ku jiro, oo uusan dadka u kala eexan. 10 Ugu
dambaysta waxaan idinku leeyahay, Ku xoogaysta Rabbiga
iyo xoogga itaalkiisa. 11 Oo hubka Ilaah oo dhan qaata,
si aad u awooddaan inaad sirta Ibliiska hor istaagtaan.
12 Waayo, innagu lama legdanno bini-aadan, laakiinse
waxaynu la legdannaa kuwa madaxda ah iyo kuwa amarka
leh iyo taliyayaasha dunida gudcurka ah iyo ruuxyada
sharka ah oo samooyinka ku jira. **(aiōn g165)** 13 Haddaba
sidaas daraaddeed hubka Ilaah qaata si aad u awooddaan
inaad maalinta sharka iyaga is-hor taagtaan, oo markaad
saas oo dhan yeeshaan aad awooddaan inaad istaagtaan.
14 Haddaba istaaga idinkoo runta dhexda ku xidhan, oo
laabtana laabdhawrka xaqnimada ku xidhan, 15 oo cagahana
gashan isu-diyaarinta injiilka nabadda, 16 oo weliba waxaa
kaloo aad qaadataan gaashaanka rumaysadka, kaas oo aad
ku awoodaysaan inaad ku wada demisaan kan sharka leh
fallaadhihiisa ololaya oo dhan. 17 Oo waxaad qaadataan
koofiyada badbaadada iyo seefta Ruuxa oo ah erayga Ilaah.
18 Mar kasta Ilaah wax kaga barya Ruuxa baryo iyo duco
kastaba, oo taas ku dhawra adkaysasho oo dhan iyo u-
ducaynta quduusiinta oo dhan. 19 Oo anigana iigu soo
duceeya in lay siiyo hadal aan afka ku furo inaan cabsila'aan
u muujiyo qarsoodiga injiilka, 20 kaas oo aan u ahay mid ergo
ah oo silsilad ku xidhan, inaan cabsila'aan ugu hadlo sida igu
waajibka ah. 21 Laakiinse inaad ogaataan axwaashayda iyo
sidaan ahayba, waxaa idiin wada sheegi doona Tukhikos oo
xagga Rabbiga ku ah walaalkay gacaliye iyo midiidin aamin
ah. 22 Waxaan isaga idiinku soo diray isla sababtan inaad
xaaladdayada ogaataan iyo inuu qalbigiinna dhiirrigeliyo. 23
Walaalaha ha u ahaadeen nabad iyo jacayl rumaysad la
jiro oo xagga Ilaaha Aabbaha ah iyo Rabbi Ciise Masiix ka
yimid. 24 Kulligood kuwa Rabbigeenna Ciise Masiix jacaylka
aan dhammaanayn ku jecel, nimco ha u ahaato.

# Filiboy

1 Annagoo ah Bawlos iyo Timoteyos, oo ah addoommadii
Ciise Masiix, waxaannu warqaddan u qoraynaa kulli
quduusiinta Ciise Masiix oo magaalada Filiboy la jooga
hoggaamiyayaasha kiniisadda iyo caawiyayaasha. 2 Nimco
ha idinla jirto iyo nabad ka timaada Ilaaha Aabbeheenna ah
iyo Rabbi Ciise Masiix. 3 Mar kastoo aan idin xusuustaba
Ilaahay baan u mahadnaqaa, 4 oo kol kasta markaan
kulligiin idiin duceeyo, waxaan idiin soo duceeyaa anigoo
faraxsan 5 wehelnimadiinna xagga ka-wadashaqaynta injiilka
aawadeed maalintii ugu horraysay ilaa haatan. 6 Anigu
waxaan aaminsanahay in kan shuqul wanaagsan idinku
dhex bilaabay uu dhammayn doono ilamaa maalinta Ciise
Masiix. 7 Haddaba sidaas daraaddeed waa igu qumman
tahay inaan sidaas kulligiin idiinka fikiro, waayo, qalbigaan
idinku hayaa, maxaa yeelay, kulligiin waxaad tihiin kuwo
nimcada igala qayb qaata xagga xidhnaantayda iyo xagga
daaficidda iyo xaqiiqaynta injiilkaba. 8 Aniga Ilaah baa iiga
markhaati ah sidaan kulligiin idinkugu xiisoonayo xagga
jacaylka Ciise Masiix. 9 Waxaan Ilaah ka baryayaa in
jacaylkiinnu aad iyo aad ugu sii bato xagga aqoonta iyo
waxgarashada oo dhan, 10 inaad waxyaalaha wanaagsan
tijaabisaan, oo aad daacad iyo ceeb ka saliin ahaataan
ilamaa maalinta Masiixa, 11 idinkoo ay midhaha xaqnimadu
idinka buuxaan, kuwaas oo Ciise Masiix ku yimaada, oo
Ilaah u ah ammaan iyo mahad. 12 Haddaba, walaalayaalow,
waxaan jeclaan lahaa inaad ogaataan in waxyaalihii igu
dhacay ay injiilka horumar u noqdeen, 13 sidaas daraaddeed
waxaa askartii boqorka iyo kuwa kale oo dhanba u wada
muuqday inaan Ciise Masiix aawadiis u xidhnahay. 14
Oo weliba walaalaha xagga Rabbiga badidood, iyagoo
xidhnaantayda ku kalsoon, ayay aad iyo aad ugu dhiirran
yihiin inay ereyga Ilaah cabsila'aan ku hadlaan. 15 Runtii
waxaa jira qaar Masiixa ku naadiya xaasidnimo iyo dirir,
qaarna waxay ku naadiyaan niyo wanaagsan. 16 Qaarko
waxay ku naadiyaan jacayl, iyagoo og in la ii doortay injiilka
daaficiddiisa, 17 laakiinse kuwa kale waxay Masiixa u
naadiyaan si ay dadka u kala qaybqaybiyaan, iyagoo aan
daacad ahayn oo ku fikiraya inay dhib igu kiciyaan anigoo
xidhan. 18 Haddaba waa sidee? Hadday iska yeelyeel
tahay iyo hadday dhab tahayba, Masiixa si kastaba waa loo
naadiyaa, oo anigu taas waan ku farxay oo weliba waan ku
farxi doonaa. 19 Waayo, waxaan ogahay in taasu badbaado
ay iigu noqonayso xagga ducadiinna iyo caawimaadda
Ruuxa Ciise Masiix, 20 sida aan aad iyo aad u filanayo
oo u rajaynayo, inaanan waxba ku ceeboobin, laakiinse
siday weligeed ahaan jirtay in haddeerna dhiirranaan oo
dhan Masiixa lagu ammaano jidhkayga, hadday tahay nolol
iyo hadday tahay dhimashoba. 21 Waayo, aniga waxaa
nolosha ii ah Masiixa, oo dhimashaduna waa ii faa'iido.
22 Laakiinse inaan jidhka ku sii noolaado, hadday taasu
tahay midhaha hawshayda, waxaan doorto garan maayo. 23
Laakiinse anigu labada dhexdoodaan ku dhibtoonayaa, oo
waxaan jeclahay inaan tago oo Masiixa la joogo, waayo,
taasu aad bay iigu roon tahay, 24 laakiinse inaan jidhka ku
sii jiro aad baa loogu sii baahan yahay idinka aawadiin. 25
Waan aaminsanahay oo waan ogahay inaan sii joogi doono,
oo aan kulligiin idinla sii joogi doono horumarkiinna iyo
farxadda rumaysadkiinna aawadood, 26 in faankiinnu Ciise
Masiix ku bato xaggayga, joogistayda aan mar kale idinla
joogo aawadeed. 27 Laakiinse dabiicaddiinnu ha ahaato mid
istaahisha injiilka Masiixa, in haddii aan imaado oo aan idin
arko, ama haddii aan maqnaadoba, aan wax xaaladdiinna ku
saabsan maqlo inaad isku ruux keliya ku taagan tihiin idinkoo
isku naf ku dadaalaya iimaanka injiilka, 28 oo idinku innaba
ha ka cabsanina cadaawayaashiinna, taas oo iyaga u ah
calaamada halaagga, laakiinse waxay idiin tahay calaamada
badbaadadiinna, taasuna waxay ka timaadaa xagga Ilaah.
29 Maxaa yeelay, waxaa laydinku siiyey Masiixa aawadiis,
mana aha inaad isaga rumaysataan oo keliya, laakiinse
inaad isaga daraaddiisna u xanuunsataan, 30 idinkoo ku
dadaalaya isku dadaalkii aad igu aragteen oo haatanna aad
igu maqashaan.

2 Haddaba haddii ay Masiixa ku jiraan dhiirrigelin iyo
qalbiqabowjis jacayl ah iyo haddii ay ku jirto walaalnimo
xagga Ruuxa iyo haddii ay ku jiraan jixinjix iyo naxariis, 2
farxaddayda buuxiya, inaad isku maan ahaataan oo aad
isku jacayl lahaataan, idinkoo isku niyo ah oo isku maan
ah. 3 Idinku waxba ha ku samaynina iskala-qaybqaybin
iyo faan bilaash ah, laakiinse wax walba ku sameeya is-
hoosaysiin, idinkoo midkiinba midka kale ku tirinayo inuu ka
kale isaga ka wanaagsan yahay. 4 Midkiin waluba yuusan
fiiro u lahaan waxyaalihiisa, laakiinse midkiin waluba fiiro
ha u lahaado waxyaalaha kuwa kale. 5 Fikirkaas oo Ciise
Masiix ku jiray, idinkana ha idinku jiro. 6 Isagu wuxuu lahaa
suuradda Ilaah, oo inuu Ilaah la mid ahaado kuma uu tirin in
taasu tahay boobis, 7 laakiinse wuu ismadhiyey, oo wuxuu
qaatay addoon suuraddiis, oo wuxuu noqday mid dad u eg, 8
oo markuu nin u ekaaday, ayuu is-hoosaysiiyey oo addeecay
inuu dhinto, xataa inuu iskutallaabta ku dhinto. 9 Haddaba
sidaas daraaddeed Ilaah isaga aad buu u sarraysiiyey, oo
wuxuu isaga siiyey magaca magac kasta ka sarreeya; 10 in

jilib kastoo ah waxyaalaha samada ku jira iyo waxyaalaha
dhulka jooga iyo waxyaalaha dhulka ka hooseeyaaba, ay
magaca Ciise u wada sujuudaan, 11 iyo in carrab kastaaba
qirto in Ciise Masiix yahay Rabbiga in Ilaaha Aabbaha ah
lagu ammaano. 12 Haddaba, gacaliyayaalow, xataa sidii aad
weligiin u addeeci jirteen, iyadoo aan ahayn intii aan idinla
joogay oo keliya, laakiinse haatan intaan idinka maqnahay si
sidii hore aad uga sii badan badbaadadiinna ku shaqaysta
cabsi iyo gariir, 13 waayo, waa Ilaah kan idinkaga dhex
shaqeeya xagga doonista iyo xagga shuqulkaba farxaddiisa
wanaagsan aawadeed. 14 Haddaba wax walba ku sameeya
gunuunac iyo muran la'aantood, 15 inaad ceeb iyo eed
la'aataan, idinkoo ah carruurtii Ilaah oo aan iin lahayn, oo ku
dhex jira qarni qalloocan oo qallafsan, kuwaas oo aad uga
dhex muuqataan sida nuurar dunida ku dhex jira, 16 idinkoo
hore u soo fidinaya ereyga nolosha, si aan anigu u helo
wax aan ku faano maalinta Masiixa, taas oo ah inaanan
micnela'aan u ordin oo aanan micnela'aan u hawshoon.
17 Oo weliba haddii laygu dul sadqeeyo allabariga iyo
hawsha rumaysadkiinna, waan farxayaa, oo kulligiin waan
idinla farxayaa, 18 oo weliba sidaas oo kale idinkuna waad
farxaysaan oo waad ila rayraysaan. 19 Laakiinse waxaan
Rabbi Ciise ka rajaynayaa inaan dhowaan idiin soo diro
Timoteyos si aan aniguna ugu farxo markii aan xaaladdiinna
ogaado. 20 Waayo, ma aan hayo nin isaga la mid ah oo
xaaladdiinna si dhab ah uga welwelaya. 21 Waayo, iyagu
waxay kulligood doonayaan waxyaalahooda, mana aha
waxyaalaha Ciise Masiix. 22 Laakiinse idinku waad taqaaniin
xaqiiqadiisa in sida ilmo aabbihiis ugu adeego uu isagu
iigula adeegay xagga injiilka. 23 Sidaas daraaddeed waxaan
rajaynayaa inaan haddiiba isaga idiin soo diro markii aan
arko sida ay xaaladdaydu u socoto. 24 Laakiinse Rabbigaan
ku kalsoonahay inaan aniga qudhayduna dhowaan idiin
iman doono. 25 Laakiinse waxaan lagamamaarmaan ku
tiriyey inaan idiin soo diro Ebafroditos oo ah walaalkay
iyo mid ila shaqeeya oo aan isku askar nahay, oo ah kii
aad soo dirteen iyo midiidinkiinna xagga baahidayda, 26
maxaa yeelay, isagu wuu idiin xiisooday kulligiin, oo aad
buu u tiiraanyooday, waayo, idinku waad maqasheen inuu
bukay, 27 oo xaqiiqa isagu wuu bukay oo dhimashuu ku
dhowaaday, laakiinse Ilaah baa u naxariistay isaga, mana
aha isaga oo keliya, laakiinse anigana wuu ii naxariistay,
inaanan lahaan caloolxumo caloolxumo dul saaran. 28
Sidaas daraaddeed anigoo aad u dadaalaya ayaan isagii soo
diray, inaad faraxdaan markii aad mar kale aragtaan, oo ay
anigana caloolxumadu iga yaraato. 29 Sidaas daraaddeed
idinkoo aad u faraxsan isaga Rabbiga ku qaabbila, oo kuwa
isaga la mid ahna maamuusa, 30 maxaa yeelay, shuqulka
Masiixa aawadiis ayuu dhimasho ugu dhowaaday, markuu
nafsaddiisa khatar u geliyey inuu dhammaystiro wixii ka
dhinnaa hawshii aad ii qabateen.

3 Walaalahayow, ugu dambaysta, waxaan idinku leeyahay,
Rabbiga ku farxa. Sida xaqiiqadaa anigu inaan isla
wixii idiin soo qoro dhib iguma aha, laakiinse idinka way
idiin roon tahay. 2 Eeyaha iska jira, oo iska jira kuwa
sharka sameeya, oo iska jira gudniinta beenta ah, 3 waayo,
innagu waxaynu nahay kuwa gudan oo Ruuxa Ilaah ku
caabuda, oo Ciise Masiix ku faana, oo aan jidhkana ku
kalsoonayn, 4 in kastoo aan aniga qudhayduba jidhka ku
kalsoonahay, haddii nin u malaynayo inuu jidhka ku kalsoon
yahay anigu waan ka sii daranahay. 5 Aniga waxaa lay
guday maalintii siddeedaad, oo waxaan ahay jinsiga reer
binu Israa'iil, oo waxaan ka ahay qabiilka Benyaamiin, oo
waxaan ahay Cibraani ka mid ah Cibraaniyada; oo xagga
sharcigana waxaan ahay Farrisi; 6 xagga qiiradana waxaan
ahaa mid silcin jiray kiniisadda, xagga xaqnimada sharciga
ku jirtana waxaan ahaa eedlaawe. 7 Habase yeeshee
waxyaalihii faa'iidada ii ahaa kuwaas Masiixa aawadiis ayaan
khasaare ku tiriyey. 8 Runtii anigu wax kasta ayaan khasaare
ku tirinayaa wanaagga aqoonta aan aqaan Rabbigayga
Ciise Masiix aawadiis, kaas oo aan aawadiis wax kasta
ugu khasaaray, oo haatan waxaan ku tirinayaa inay yihiin
qushaash inaan Masiix faa'iido ahaan u helo 9 oo isaga
dhexdiisa layga helo, anigoo aan lahayn xaqnimo tayda ah,
taas oo sharciga laga helo, laakiinse anigoo leh tan laga
helo rumaysadka Masiixa, taas oo ah xaqnimada xagga
Ilaah rumaysadka lagaga helo, 10 inaan ogaado isaga iyo
xoogga sarakiciddiisa iyo wadawadaagidda xanuunsigiisa,
anigoo isaga xagga dhimashadiisa ugu ekaanaya, 11 si
kasta ha ahaatee haddii aan gaadhi karo sarakicidda kuwii
dhintay. 12 Mana aha inaan hore u helay amase hore la ii
kaamilay, laakiinse waan ku sii dadaalayaa inaan qabsado
wixii Ciise Masiix ii qabtay. 13 Walaalahayow, anigu ku tirin
maayo inaan aniga qudhaydu weli qabsaday, laakiinse wax
keliya ayaan samaynayaa, waxyaalihii iga dambeeyey intaan
illoobo ayaan waxaan laacayaa waxyaalaha iga horreeya.
14 Anigu waxaan dadaal ugu roorayaa xagga goolka iyo
ilaa abaalgudka yeedhista sare oo Ilaah oo ah xagga Ciise
Masiix. 15 Sidaas daraaddeed in alla inteennii kaamil ahu
aan sidaas ku fikirno, oo haddii aad si kala duwan wax
kaga fikirtaan, xataa waxaas Ilaah baa idiin muujin doona.
16 Laakiin wixii aynu hore u gaadhnay, isla waxaas aynu
ku soconno. 17 Walaalayaalow, idinku kulligiin igu wada

dayda, oo u fiirsada kuwa sidaas u socda xataa sidaad
annaga masaal noogu haysataan. 18 Waayo, waxaa jira
kuwa badan oo socda oo aan marar badan wax idiinka
sheegay, oo aan haddana anigoo ooyaya idiin sheegayo
inay yihiin cadaawayaasha iskutallaabta Masiixa, 19 oo
kuwaas dhammaadkoodu waa halligaad, ilaahooduna waa
caloosha, ammaantooduna waxay ku jirtaa ceebtooda, oo
waxay ka fikiraan waxyaalaha dunida. 20 Laakiinse innaga
waddaninimadeennu waxay ku jirtaa jannada halkaasoo
aynu weliba ka sugayno Badbaadiye kaas oo ah Rabbi
Ciise Masiix. 21 Isagu wuxuu beddeli doonaa jidhkeenna
liita inuu u ekaado jidhkiisa ammaanta leh, oo wuxuu ku
beddelayaa xoogga uu isagu ku awoodo inuu wax kastaba
isaga hoosaysiiyo.

4 Sidaas daraaddeed walaalahayga aan jeclahay oo
aan u xiisoonayow, idinku waxaad tihiin farxaddayda
iyo taajkayga. Gacaliyayaalow, xagga Rabbiga saas ugu
xoogaysta. 2 Waxaan waaninayaa Yu'odiya, oo waxaan
waaninayaa Suntukhee inay labadoodu xagga Rabbiga
isku maan ahaadaan. 3 Ka ila shaqeeya oo runta ahow,
waxaan kaa baryayaa inaad dumarkaas caawiso, waayo,
iyaga iyo Kaleemeentos iyo kuwa kaloo ila shaqeeyaba oo
magacyadoodu ku qoran yihiin kitaabka nolosha, waxay
iila dhibtoodeen injiilka aawadiis. 4 Mar kasta Rabbiga ku
faraxsanaada, oo weliba waxaan idin leeyahay, Farxa. 5
Qabownimadiinna dadka oo dhammu ha ogaado, waayo,
Rabbigu waa soo dhow yahay. 6 Waxba ha ka welwelina,
laakiinse wax kastaba baryadiinna Ilaah ku ogeysiiya tukasho
iyo duco mahadnaqid la jirto. 7 Oo nabadda Ilaah oo
waxgarasho kasta ka sarraysa ayaa waxay qalbiyadiinna
iyo fikirradiinna ku dhawri doontaa Ciise Masiix. 8 Ugu
dambaysta, walaalayaalow, waxaan idinku leeyahay, Wax
kasta oo run ah, iyo wax kasta oo sharaf leh, iyo wax kasta
oo xaq ah, iyo wax kasta oo daahir ah, iyo wax kasta oo
door ah, iyo wax kasta oo wanaag laga sheego, haddii
wanaag ku jiro iyo haddii ammaanu ku jirto, waxyaalahan
ka fiirsada. 9 Idinku sameeya waxyaalihii aad barateen,
oo aad hesheen, oo aad maqasheen, oo aad aniga igu
aragteen; oo Ilaaha nabadduna wuu idinla jiri doonaa. 10
Laakiin Rabbiga aad baan ugu faraxsanahay inaad haatan
ugu dambaysta mar kale iga fikirteen; taas oo aad ka fikiri
jirteen laakiin aad fursad u weydeen. 11 Ka hadli maayo
baahi, waayo, waxaan bartay inaan raalli ku ahaado hadba
xaaladdii aan ku jiro. 12 Waxaan aqaan saboolnimada,
oo weliba waxaan aqaanna barwaaqada. Meel kasta iyo
wax walba waxaan ku bartay dhergidda iyo gaajadaba,
barwaaqada iyo baahidaba. 13 Wax walba waan ku samayn
karaa gargaarkiisa kan i xoogeeya. 14 Habase yeeshee
si wanaagsan baad yeesheen markaad dhibaatadayda ila
qaybsateen. 15 Idinka qudhiinnuba waad taqaaniin, reer
Filiboyow, in injiilka bilowgiisii markii aan Makedoniya ka
soo kacay aan kiniisaduna ila qaybsan waxa ku saabsan
bixinta iyo helidda, idinkoo keliya mooyaane. 16 Waayo,
xataa markii aan Tesaloniika joogay, idinku mar iyo labaad ii
soo dirteen wixii aan u baahnaa. 17 Ma aha inaan hadiyad
doonayo, laakiin waxaan doonayaa midhaha xaggiinna ku
kordhaya. 18 Laakiinse anigu wax kastaba waan haystaa, oo
waan barwaaqaysanahay. Waan dheregsanahay, waayo,
waxaan Ebafroditos ka helay wixii aad ii soo dirteen, kuwaas
oo ah allabari Ilaah aqbali karo oo uu aad ugu farxo oo caraf
udgoon leh. 19 Ilaahaygu wuu idin siin doonaa wixii aad u
baahan tihiin oo dhan, sida ay tahay hodantinimadiisa xagga
ammaanta Ciise Masiix ku jirta. 20 Haddaba ammaanu
ha u ahaato Ilaaha Aabbeheenna ah weligiis iyo weligiis.
Aamiin. **(aiōn g165)** 21 Igu salaama mid kasta oo ka mid ah
quduusiinta Ciise Masiix. Walaalaha ila joogaa way idin soo
salaamayaan. 22 Quduusiinta oo dhammu way idin soo
salaamayaan, khusuusan kuwa guriga Kaysar jooga. 23
Nimcada Rabbi Ciise Masiix ha la jirto ruuxiinna.

# Kolosay

1 Anigoo ah Bawlos, oo ah rasuulkii Ciise Masiix xagga
doonista Ilaah, iyo walaalkeen Timoteyos, 2 waxaannu
warqaddan u qoraynaa quduusiinta iyo walaalaha aaminka
ah ee Masiixa ku jira oo Kolosay jooga. Nimco ha idinla jirto
iyo nabad ka timaada Ilaaha Aabbeheenna ah. 3 Waxaannu
ku mahadnaqnaa Ilaaha ah Aabbaha Rabbigeenna Ciise
Masiix, annagoo had iyo goorba idiin soo ducaynayna. 4
Waxaannu maqalnay rumaysadkiinna xagga Ciise Masiix
iyo jacaylka aad quduusiinta oo dhan u qabtaan, 5 rajada
jannada laydiin dhigay aawadeed, taas oo aad hore ugu
maqasheen hadalka runta ah oo injiilka. 6 Kaasu waa idiin
yimid, xataa siduu ugu yimid dunida oo dhan isagoo midho
dhalaya oo kordhaya, sida uu idinkana midho idiinku dhalayo
oo idiinku kordhayo, tan iyo maalintii aad maqasheen oo aad
ogaateen nimcada Ilaah oo runta ku jirta. 7 Sidaasaad ka
barateen gacaliyeheenna Ebafras oo addoon nala ah, oo
Masiixa u ah midiidin aamin ah aawadeen, 8 kaas oo weliba
noo caddeeyey jacaylkiinna Ruuxa ku jira. 9 Sababtaas
daraaddeed tan iyo maalintii aannu taas maqalnay ma
aannu joojin inaannu idiin soo ducayno. Waxaannu Ilaah
idiin baryaynaa inay idinka buuxsanto aqoonta doonistiisa
xagga xigmadda iyo waxgarashada Ruuxa oo dhan, 10
inaad u socotaan si Rabbiga istaahisha oo aad wax kasta
isaga kaga farxisaan, idinkoo midho ku soo saaraya shuqul
kasta oo wanaagsan oo ku sii kordhaya aqoonta Ilaah. 11
Weliba waxaannu Ilaah baryaynaa inaad ku xoogaysataan
xoog oo dhan sida uu yahay itaalka ammaantiisu xagga
adkaysashada iyo dulqaadashada farxaddu la jirto oo dhan.
12 Mahad baannu u naqaynaa Aabbaha inaga dhigay
kuwa istaahila inay ka qayb qaataan dhaxalka quduusiinta
nuurka ku jirta. 13 Isagu waa inaga samatabbixiyey xoogga
gudcurka, oo wuxuu inoo beddelay boqortooyadii Wiilka
jacaylkiisa, 14 kaas oo aynu ku leennahay madaxfurasho
ah dembidhaafka. 15 Isagu waa suuraddii Ilaaha aan
la arki karin, oo ah curadka uunka oo dhan; 16 waayo,
wax kastaba isagaa uumay, waxyaalaha samooyinka ku
jira, iyo waxyaalaha dhulka joogaba, waxyaalaha la arki
karo iyo waxyaalaha aan la arki karinba, hadday yihiin
carshiyo ama sayidnimo ama madax ama amarro; wax
walba isagaa uumay oo loo uumay. 17 Isagu wax kastaba
wuu ka horreeyaa, oo wax kastaaba isagay isku haystaan.
18 Oo isagu waa madaxa jidhka, kaas oo ah kiniisadda, oo
isagu waa bilowgii iyo curadka kuwii dhintay ka kacay, si uu
uga horreeyo wax kastaba. 19 Waayo, waxaa Aabbaha ka
farxisay in buuxnaanta oo dhammu ay isaga ku jirto, 20 iyo
inuu isaga wax kastaba xaggiisa kula heshiiyo, isagoo kula
nabday dhiiga iskutallaabtiisa; hadday yihiin waxyaalaha
dhulka jooga ama hadday yihiin waxyaalaha samooyinka
ku jiraba. 21 Idinku waa hore waxaad ahaydeen kuwo
ajanabi laga dhigay, oo maankiinnana cadow baad ka
ahaydeen xagga shuqulladiinna sharka ah, 22 laakiinse
haatan isagu wuxuu idinkula heshiiyey jidhkiisii aadmiga
oo dhintay, inuu isagu hortiisa idin keeno idinkoo quduus
ah oo aan iin iyo eed midna lahayn, 23 haddii aad ku sii
jirtaan iimaanka, oo aad gun iyo xidid adag ku leedihiin, oo
aydnaan ka fogaan rajadii injiilkii aad maqasheen, kaas oo
lagu wacdiyey uunka samada ka hooseeya oo dhan, oo
anigoo Bawlos ah layga dhigay midiidin. 24 Haatan waxaan
ku farxaa xanuunsigayga aan idiin xanuunsado, oo waxaan
dhammaystiraa dhibaatooyinka Masiixa oo jidhkayga ku
dhiman jidhkiisa aawadiis kaasoo ah kiniisadda. 25 Taas
waxaa la iiga dhigay midiidin xagga wakiilnimada Ilaah oo
aniga aawadiin la ii siiyey inaan dhammaan erayga Ilaah
ku wada wacdiyo. 26 Wuxuu ahaa wax aan la garanayn
oo qarsoonaa tan iyo weligiis iyo qarni kasta, laakiinse
haatan waxaa loo muujiyey quduusiintiisa. **(aiōn g165)** 27
Kuwaas Ilaah baa ku farxay inuu iyaga ogeysiiyo waxa ay
tahay hodantinimada ammaanta qarsoodigan ee ku dhex
jira quruumaha, kaas oo ah Masiixa idinku jira oo ah rajada
ammaanta. 28 Isaga waannu naadinnaa, annagoo nin kasta
waaninayna oo nin kasta wax ku barayna xigmad oo dhan,
inaannu nin walba hor keenno isagoo Masiixa kaamil ku ah.
29 Taas ayaan u hawshoodaa anigoo aad u dadaalaya sida
uu yahay shuqulkiisa si xoog leh igaga dhex shaqeeyaa.

2 Waxaan jeclaan lahaa inaad ogaataan sida weyn oo
aan idiinku dadaalayo idinka iyo kuwa La'odikiya jooga
iyo in alla intii aan arag wejigayga anoo nool; 2 inay
qalbiyadoodu dhiirranaadaan, iyagoo jacayl isugu xidhan, iyo
inay wada helaan hodantinimada hubaasha waxgarashada,
inay ogaadaan qarsoodiga Ilaah, kaas oo ah Masiixa. 3
Isaga waxaa ku wada qarsoon waxyaalaha qaaliga ah
oo dhan oo ah xigmadda iyo aqoonta. 4 Taas waxaan u
leeyahay inaan ninna idinku khiyaanayn hadal sasabasho
ah. 5 In kastoo aan idinka maqnahay xagga jidhka, weliba
waan idinla joogaa xagga ruuxa, anigoo faraxsan oo fiirinaya
nidaamkiinna iyo adkaanta rumaysadkiinna, xagga Masiixa.
6 Haddaba sidaad u aqbasheen Rabbi Ciise Masiix, ku
socda, 7 idinkoo isaga xidid ku yeeshay oo ku dhismay,
oo rumaysadkiinna ku adkaaday, taas oo ah sidii laydiin
baray, oo aad u mahadnaqa. 8 Iska jira yaan ninna idinku
dhicin faylosofiyadiisa iyo khiyaanadiisa bilaashka ah xagga

caadooyinka dadka iyo waxyaalaha dunida ugu horreeya
oo aan ka iman xagga Masiixa, 9 waayo, buuxnaanta
Ilaahnimada oo dhammu waa ku jirtaa isagoo jidh leh, 10 oo
waa laydin buuxiyey idinkoo ku jira isagoo ah madaxa taaliye
kasta iyo amar kasta. 11 Oo isaga xaggiisaa laydinkaga
guday gudniin aan gacmo lagu samayn markii aad gudniinta
Masiixa ku xoorteen jidhka aadmiga. 12 Idinka waxaa isaga
laydinkula aasay baabtiiska, kaas oo isaga laydinkula soo
kiciyey xagga rumaysadka aad u qabtaan xoogga Ilaah oo
shaqeeya oo isaga kuwii dhintay ka soo sara kiciyey. 13
Idinkoo ku dhintay xadgudubyadiinnii iyo buuryoqabnimadii
jidhkiinna ayuu weliba isaga idinla soo noolaysiiyey, isagoo
inaga cafiyey xadgudubyadeennii oo dhan. 14 Wuxuu
baabbi'iyey dacwadii inoogu qornayd qaynuunnada oo inaga
geesta ahayd, oo weliba intuu fogeeyey ayuu ku qodbay
iskutallaabta. 15 Isagu hubkuu ka qaaday taliyayaasha iyo
kuwa amarka leh, oo bayaan ayuu u ceebeeyey, isagoo
iyaga kaga guulaysanaya. 16 Haddaba ninna yuusan idinku
xukumin wax ku saabsan cunto ama cabbid ama maalin iid
ah ama bil dhalatay ama maalmaha sabtida, 17 kuwaas
oo ah hooska waxyaalaha iman doona, laakiinse jidhka
waxaa iska leh Masiixa. 18 Ninna yuusan abaalgudkiinna
idinka dulmin isagoo idin oggolaysiinaya is-hoosaysiinta iyo
malaa'ig caabudidda, oo dhex gelaya waxyaalaha uusan
arkin, oo micnela'aan ugu kibraya maankiisa aadmiga, 19 oo
aan xajisanayn Madaxa jidhka oo dhammu wax ka helo, oo
xubnaha iyo seedaha isku haysta, oo kordhinta Ilaah ku
kordha. 20 Haddii aad Masiixa kala dhimateen waxyaalaha
dunida ugu horreeya, maxaad sidii idinkoo dunida ku nool
isaga hoosaysiisaan qaynuunnada, 21 kuwaas oo leh, Ha
qaban, Ha dhadhamin, Ha taaban? 22 Waxyaalahaas oo
dhan ayaa isticmaal ku wada baabba'aya. Qaynuunnadu
waxay ka yimaadeen amarrada iyo cilmiga dadka. 23
Waxyaalahaasu sida haqiiqada ah waxay leeyihiin muuqasho
xigmad ah xagga caabudidda qof naftiisa ku qasbo iyo is-
hoosaysiinta iyo saxariirinta jidhka, laakiinse iyagu faa'iido
ma leh ay ku hor joogsadaan dherjinta jidhka.

3 Haddaba haddii laydinla soo sara kiciyey Masiix,
doondoona waxyaalaha korka yaal, meesha uu Masiixu
joogo, isagoo fadhiya midigta Ilaah. 2 Ka fikira waxyaalaha
korka yaal, hana ka fikirina waxyaalaha dhulka yaal. 3
Waayo, idinku waad dhimateen, oo noloshiinnuna Masiixay
kula qarsoon tahay Ilaah. 4 Masiixa oo ah nolosheenna,
markuu soo muuqdo, kolkaasaad idinkuna ammaan kula
soo muuqan doontaan. 5 Haddaba dila xubnihiinna dhulka
yaal, kuwaas oo ah sino, iyo wasakhnimo, iyo kacsi xaaraan
ah, iyo damac shar ah, iyo hunguri xumaan, taas oo
ah sanam caabudid, 6 waxyaalahaas oo daraaddood ay
cadhada Ilaah ugu soo degto carruurta caasinimada. 7
Kuwaas ayaad waagii hore ku socon jirteen markii aad
waxyaalahaas ku noolaan jirteen. 8 Laakiinse haatan iska
fogeeya waxyaalahan oo dhan, kuwaas oo ah xanaaq, iyo
cadho, iyo xumaan, iyo cay, iyo hadalka ceebta ah oo afkiinna
ka baxa. 9 Been ha isu sheegina, waayo, idinku waad iska
xoorteen dabiicaddii hore iyo falimaheediiba, 10 oo waxaad
huwateen dabiicadii cusbayd taas oo loo cusboonaysiinayo
aqoon sida ay tahay u-ekaanta kan iyada abuuray. 11
Halkaas ma jiri karaan Gariig ama Yuhuudi, mid gudan
ama mid buuryoqab ah, reer Barbari, ama reer Iskutees,
addoon ama xor; laakiinse Masiixu waa wax walba, oo wax
walba wuu ku jiraa. 12 Haddaba sidaas daraaddeed idinku
sida kuwa Ilaah doortay oo quduuska ah oo la jecel yahay,
huwada qalbi leh naxariis iyo roonaan iyo is-hoosaysiin
iyo qaboobaan iyo dulqaadasho. 13 Midkiinba midka kale
ha u dulqaato oo ha cafiyo, haddii mid ka cabanayo mid
kale; xataa sida Rabbiguba idiin cafiyey, idinkuna sidaas oo
kale yeela: 14 oo waxyaalahaas oo dhan waxaad ka dul
huwataan jacayl, kaas oo ah xidhiidhka kaamilnimada. 15
Oo nabadda Masiixuna ha ku taliso qalbiyadiinna, taas oo
laysugu kiin yeedhay isku jidh keliya; oo mahadnaqayaal
ahaada. 16 Oo erayga Masiixu ha idiinku jiro si badan xagga
xigmadda oo dhan, idinkoo wax isbaraya oo isku waaninaya
sabuurro iyo heeso ammaan ah iyo gabayo xagga ruuxa,
idinkoo Ilaah ugu gabyaya nimcada qalbiyadiinna ku jirta. 17
Oo wax alla wixii aad ku samaysaan hadal ama shuqulba,
magaca Rabbi Ciise ku wada sameeya oo Ilaaha Aabbaha
ah ugu mahadnaqa isaga. 18 Dumar yahow, nimankiinna
ka dambeeya sida ay ugu habboon tahay xagga Rabbiga.
19 Nimankow, idinkuna afooyinkiinna jeclaada oo ha ku
qadhaadhoobina. 20 Carruurtoy, waalidkiinna wax kastaba
ku addeeca, waayo, taasu waa ka farxisaa Rabbiga. 21
Aabbayaashow, carruurtiinna ha ka cadhaysiinina, yeeyan
qalbi jabine. 22 Addoommadow, wax kastaba ku addeeca
kuwa xagga jidhka sayidyadiinna ah; hana ahaanina kuwo
markii loo jeedo oo keliya shaqeeya sida kuwa dadka ka
farxiya, laakiinse ku adeega qalbi daacad ah, idinkoo Rabbiga
ka cabsanaya. 23 Wax alla wixii aad samaysaanba, xagga
qalbiga ka sameeya, sidii idinkoo Rabbiga u samaynaya
oo aan dad aawadiis u samaynayn, 24 idinkoo garanaya
inaad xagga Rabbiga ka heli doontaan abaalgudkii dhaxalka.
Waxaad u adeegtaan Rabbiga Masiixa ah. 25 Waayo, kii
xumaan falaa wuxuu dib u heli doonaa xumaantuu falay,
waayo, dadka looma kala eexdo.

4 Sayidyadow, addoommadiinna siiya waxa xaqa ah oo u
qalma, idinkoo garanaya inaad jannada Sayid ku leedihiin.
2 Haddaba baryada ku sii adkaada, idinkoo ku soo jeeda oo
mahadnaqaya. 3 Oo weliba annagana noo soo duceeya
in Ilaah noo furo albaabka hadalka, si aannu uga hadalno
qarsoodiga Masiixa, kaas oo aan u xidhnahay; 4 inaan u
muujiyo, sida igu waajibka ah inaan uga hadlo. 5 Kuwa
dibadda jooga xaggooda xigmad ku socda, oo wakhtiga
ku faa'iidaysta. 6 Mar kasta hadalkiinnu nimco ha lahaado
isagoo cusbo lagu daray, inaad ogaataan sida idinku waajibka
ah inaad mid kasta ugu jawaabtaan. 7 Axwaalkayga oo dhan
waxaa idiin sheegi doona walaalkeen Tukhikos oo ah gacaliye
iyo midiidin aamin ah oo addoon ila ah xagga Rabbiga.
8 Isagaan idiinku soo diray sababtan daraaddeed, inaad
ogaataan axwaalkayaga iyo inuu qalbiyadiinna dhiirrigeliyo, 9
oo weliba waxaan isaga la soo diray walaalkeen Oneesimos,
kaas oo ah mid aamin ah iyo gacaliye, oo idinka mid ah.
Iyagu waxay idiinka warrami doonaan waxa meeshan ka
dhacay oo dhan. 10 Waxaa idin soo salaamaya Aristarkhos
oo ila xidhan, iyo Markos oo Barnabas abti u yahay, kaas
oo wax isaga ku saabsan laydinku amray; hadduu idiin
yimaado aqbala. 11 Weliba waxaa idin soo salaamaya Ciise
oo la yidhaahdo Yuustos. Kuwaas oo ka mid ah kuwa
gudan ayaa ah kuwa keliya oo iila shaqeeya boqortooyada
Ilaah, iyagoo ii noqday kuwo i dhiirrigeliyey. 12 Waxaa
kaloo idin soo salaamaya Ebafras, oo idinka mid ah, oo ah
addoonkii Ciise Masiix. Kol kastaba baryadiisa ayuu idiinku
dadaalaa inaad istaagtaan, idinkoo kaamil ah oo aad u huba
doonista Ilaah oo dhan. 13 Waxaan ugu markhaati furayaa
inuu u hawshoodo idinka aawadiin iyo kuwa La'odikiya
jooga iyo kuwa Hi'erabolis jooga aawadood. 14 Waxaa idin
soo salaamaya Luukos oo ah gacaliyaha dakhtarkaa iyo
Deemaas. 15 Walaalaha La'odikiya jooga iyo Numfas, iyo
kiniisadda gurigiisa ku jirta nagu salaama. 16 Warqaddan
markii laydinka dhex akhriyo, haddana ha laga dhex akhriyo
kiniisadda reer La'odikiya, oo idinkuna akhrista warqadda
aad La'odikiya ka heli doontaan. 17 Oo Arkhibbos waxaad
ku tidhaahdaan, Adeegiddii xagga Rabbiga oo aad heshay,
ku dadaal inaad dhammaysid. 18 Anigoo Bawlos ah ayaa
salaantan gacantayda ku qoraya. Xusuusta xidhnaantayda.
Nimco ha idinla jirto.

# 1 Tesaloniika

**1** Annagoo ah Bawlos iyo Silwanos iyo Timoteyos waxaannu
warqaddan u qoraynaa dadka Tesaloniika kiniisaddooda
oo ku jirta Ilaaha Aabbaha ah iyo Rabbi Ciise Masiix.
Nimco ha idinla jirto iyo nabadu. **2** Had iyo goorba Ilaah
baannu idiinku mahadnaqnaa kulligiin, annagoo baryadayada
idinku xusuusanayna. **3** Waxaannu joogsila'aan Ilaaheenna
oo ah Aabbeheenna hortiis ku xusuusannaa shuqulka
rumaysadkiinna iyo hawsha jacaylkiinna iyo dulqaadashada
rajadiinna ee ku jira Rabbigeenna Ciise Masiix. **4** Annagu
waannu og nahay, walaalaha Ilaah jecel yahayow, in Ilaah
idin doortay, **5** waayo, injiilkayagu idiinkuma iman hadal
oo keliya, laakiinse wuxuu kaloo idiinku yimid xoog iyo
Ruuxa Quduuska ah iyo hubaal badan. Waad garanaysaan
caynkaannu dhexdiinna ku ahayn idinka aawadiin. **6** Oo
waxaad noqoteen kuwo ku dayda annaga iyo Rabbigaba,
idinkoo ereyga ku helay dhib badan iyo farxadda Ruuxa
Quduuska ah. **7** Sidaas daraaddeed masaal baad u noqoteen
kuwa rumaystay oo Makedoniya iyo Akhaya jooga oo dhan.
**8** Waayo, ereygii Rabbigaa idinka dhawaaqay, mana aha
Makedoniya iyo Akhaya dhexdooda oo keliya, laakiinse
rumaysadkiinna xagga Ilaah wuxuu gaadhay meel kasta;
oo sidaas daraaddeed uma aannu baahnin inaannu wax
nidhaahno. **9** Waayo, iyaguba waxay ka warramaan wax
nagu saabsan oo ah sidaannu idiinku soo galnay, iyo sidaad
sanamyadii uga jeesateen oo Ilaah ugu soo jeesateen, inaad
u adeegtaan Ilaaha nool oo runta ah, **10** oo aad samada ka
sugtaan Wiilkiisa uu kuwii dhintay ka soo sara kiciyey oo ah
Ciisaha inaga samatabbixinaya cadhada imanaysa.

**2** Waayo, walaalayaalow, waxaad og tihiin imaatinkayagii
aannu idiin nimid inuusan noqon mid aan waxtar lahayn.
**2** Laakiinse annagoo awil aad ugu xanuunsannay oo
lanagu ceebeeyey Filiboy, sidaad og tihiin, waxaannu ku
dhiirranaannay Ilaaheenna inaannu injiilka Ilaah idiin sheegno
annagoo dhib badan ku jirna. **3** Waayo, waanadayadu
kama iman qalad ama wasakh ama khiyaano, **4** laakiinse
siduu Ilaah noogu bogay inuu nagu ammaaneeyo injiilka,
sidaasaannu u hadalnaa, mana aha inaannu dadka ka
farxinno, laakiinse inaannu ka farxinno Ilaaha qalbigayaga
imtixaama. **5** Sidaad og tihiin, marnaba kuma aannu
isticmaalin hadal sasabasho ah ama damacnimo qarsoon,
oo taas Ilaah baa marag ka ah. **6** Dadka xaggiisana ammaan
kama aannu doondoonin, ama xaggiinna ha noqoto, ama
xagga dad kale, in kastoo aan culaab idinku noqon kari
lahayn, annagoo ah rasuulladii Masiixa. **7** Laakiin dhexdiinna
waxaannu idiinku roonayn sida mid carruurteeda nuujisa ay
iyaga u dhaqaalayso. **8** Sidaas daraaddeed, annagoo aad
idiin jecel, ayaannu ku faraxnay inaannu wax idin siinno,
mana aha injiilka Ilaah oo keliya, laakiinse xataa naftayada,
maxaa yeelay, waxaad noo noqoteen kuwo aan jecel nahay.
**9** Waayo, waad xusuusan tihiin, walaalayaalow, sidaannu
dhib iyo daal ugu shaqaynay habeen iyo maalinba, inaannan
midkiinna culaysin, oo waxaannu idinku wacdinnay injiilka
Ilaah. **10** Idinkuna markhaati baad ka tihiin, Ilaahna wuu
ka yahay, sidaannu daahir iyo xaq iyo ceebla'aan kula
macaamiloonnay kuwiinna rumaysan. **11** Sidaad og tihiin
waxaannu midkiin kastaba kula macaamiloonnay sida aabbe
carruurtiisa ula macaamiloodo, annagoo idin waaninayna oo
idin dhiirigelinayna oo idiin markhaati furayna, **12** inaad u
socotaan si istaahisha Ilaaha idiinku yeedhay boqortooyadiisa
iyo ammaantiisa. **13** Oo sababtaas daraaddeed ayaannu
joogsila'aan Ilaah ugu mahadnaqnaa in, markii aad naga
hesheen ereygii Ilaah oo aad naga maqasheen, aydnaan
u aqbalin sidii dad hadalkiis laakiin siduu run u yahay
ereygii Ilaah oo haddana idinka dhex shaqeeya kuwiinna
rumaysan. **14** Waayo, walaalayaalow, waxaad noqoteen
kuwo ku dayday dadka kiniisadaha Ilaah oo Yahuudiya
jooga, kuwaas oo ah kuwa Ciise Masiix, maxaa yeelay,
idinkuna waxaad dadkiinna ka hesheen dhibtaas oo kale,
siday iyaguba uga heleen Yuhuudda, **15** oo ah kuwii dilay
Rabbi Ciise iyo nebiyadiiba, oo annagana dibadda noo
eryay, oo aan Ilaah ka farxin, dadka oo dhanna ka geesta
ah. **16** Oo waxay noo diidaan inaannu dadka aan Yuhuudda
ahayn la hadalno inay badbaadaan. Sidaasay mar walba
dembiyadooda u dhammaystiraan, laakiin ugu dambaysta
cadhada waa ku dul degtay. **17** Laakiin, walaalayaalow,
annagoo wakhti yar lanaga kiin qaaday, xagga isla-joogidda
ee ayan ahayn xagga qalbiga, aad iyo aad baannu ugu
dadaalnay inaannu wejigiinna aragno, annagoo xiiso weyn
u qabna; **18** waayo, waannu jeclaan lahayn inaannu idiin
nimaadno, anigoo Bawlos ah mar iyo lababa waan jeclaa,
laakiinse Shayddaan baa naga hor joogsaday. **19** Maxaa
yeelay, waa ayo rajadayada iyo farxaddayada iyo taajka
faanidda oo ahaan doona Rabbigeenna Ciise Masiix hortiisa
goortuu yimaado? Sow idinka ma aha? **20** Waa idinka
faankayaga iyo farxaddayaduba.

**3** Sidaas daraaddeed markii aannu is-hayn kari waynay,
way nala wanaagsanayd inaannu keliyahaantayo Ateenay
ku hadhno; **2** oo waxaannu idiin soo dirnay walaalkayo
Timoteyos, oo ah midiidinka Ilaah xagga injiilka Masiixa, inuu
idin xoogeeyo oo idin dhiirrigeliyo xagga rumaysadkiinna, **3**

inaan dhibaatooyinkani ninna dhaqdhaqaajin, waayo, idinka
qudhiinnuba waad ogsoon tihiin in tan lanoo doortay. 4
Waayo, markii aannu idinla joognay, horaannu idiinku sii
sheegnay inaannu dhibtoonayno; waana sida ay noqotay,
idinkuna waad og tihiin. 5 Sababtaas daraaddeed markii
aan is-hayn kari waayay, waxaan idiinku soo cid diray inaan
rumaysadkiinna ogaado, waaba intaasoo kii wax jirrabi
jiray idin jirrabay oo hawshayadii wax aan waxtar lahayn
noqotaye. 6 Laakiinse haatan markii Timoteyos nooga kiin
yimid, wuxuu noo keenay warka wanaagsan oo ku saabsan
rumaysadkiinna iyo jacaylkiinna, iyo inaad kol kasta si
wanaagsan noo xusuusataan idinkoo xiiso u qaba inaad na
aragtaan sida aannu annaguba xiiso ugu qabno inaannu idin
aragno; 7 sababtaas daraaddeed, walaalayaalow, dhibkayagii
iyo qaxarkayagii oo dhan waxaannu kaga qalbi qabownay
xaggiinna, rumaysadkiinna aawadiis; 8 maxaa yeelay,
haatan annagu waa nool nahay haddaad xagga Rabbiga ku
xoogaysataan. 9 Waayo, mahad intee le'eg baannu Ilaah ugu
naqi karnaa idinka aawadiin iyo farxaddii oo dhan oo aannu
ku faraxnay Ilaahayaga hortiisa idinka aawadiin? 10 Habeen
iyo maalinba aad iyo aad baannu Ilaah u baryaynaa inaannu
wejigiinna aragno oo aannu dhammaystirno waxa ka dhiman
rumaysadkiinna. 11 Haddaba Ilaaha ah Aabbeheenna iyo
Rabbigeenna Ciise qudhiisu jidkayaga xaggiinna ha ku
soo toosiyeen. 12 Rabbigu ha idiin kordhiyo oo ha idiin
badiyo jacaylka midkiinba midka kale u qabo iyo dadka
kale oo dhanba, sida aan annaguba idiin jecel nahay, 13
inuu xoogeeyo qalbiyadiinna iyagoo aan ceeb lahayn oo
quduusnimo ku jira Ilaaheenna oo ah Aabbeheenna hortiisa,
goortii Rabbigeenna Ciise la yimaado quduusiintiisa oo
dhan.

**4** Ugu dambaysta, walaalayaalow, waxaannu idinku
baryaynaa oo idinku waaninaynaa Rabbi Ciise, sidaad
nooga hesheen sidii waajibka idinku ahayd inaad u socotaan
oo Ilaah uga farxisaan, in sidaad ku socotaan, aad si ka
badan u socotaan. 2 Waayo, amarradii aan Rabbi Ciise
idinku siinnay waad og tihiin. 3 Maxaa yeelay, doonista Ilaah
waxaa weeyaan inaad quduus ahaataan oo aad sino ka
fogaataan, 4 in midkiin kastaaba garto siduu weelkiisa ugu
hayn lahaa quduusnaan iyo maamuus, 5 mana aha inuu
hammadda damaca xaaraanta ah ku socdo sida dadka aan
Ilaah aqoonin; 6 inaan ninna xadgudbin oo walaalkiis xaalkan
ku xumayn, maxaa yeelay, Rabbigu waa mid ka aarguda
waxyaalahan oo dhan sidaannu mar hore idiinku dignay oo
idiinku sii sheegnay. 7 Waayo, Ilaah wasakhnimo inooguma
yeedhin, laakiinse wuxuu inoogu yeedhay quduusnaan. 8
Sidaas daraaddeed kii diidaa, dad ma diido, wuxuuse diidaa
Ilaaha idin siiya Ruuxiisa Quduuska ah. 9 Laakiinse xagga
jacaylka walaalaha loo qabo uma aad baahnidin in wax
laydiin soo qoro, maxaa yeelay, idinka qudhiinnaba Ilaah
baa idin baray in midkiinba midka kale jeclaado. 10 Waayo,
sidaasaad jeceshihiin kulli walaalaha jooga Makedoniya oo
dhan. Laakiin waxaannu idinku waaninaynaa, walaalayaalow,
inaad intaas aad uga sii badisaan, 11 oo aad u dadaashaan
inaad nabdoonaataan, oo aad dantiinna ku joogtaan oo aad
gacmihiinna ku shaqaysaan, sidaannu idinkugu amarnay; 12
inaad sida idiin eg ugu socotaan xagga kuwa dibadda jooga,
oo aydnaan waxba u baahnaan. 13 Laakiin walaalayaalow,
dooni mayno inaad jaahil ka ahaataan waxa ku saabsan kuwii
dhintay ee waxaannu doonaynaa inaydnaan calool xumaan
sida kuwa kale oo aan rajo lahayn. 14 Waayo, haddaynu
rumaysan nahay in Ciise dhintay oo haddana soo sara
kacay, de sidaas oo kalaa kuwii Ciise rumaysnaa oo dhintay
Ilaah la keeni doonaa isaga. 15 Waayo, tan waxaannu idiinku
leennahay ereyga Rabbiga in kuweenna nool oo hadha ilaa
imaatinka Rabbiga, sinaba ugama hor mari doonno kuwii
dhintay. 16 Maxaa yeelay, Rabbiga qudhiisu samaduu kala
soo degi doonaa qaylo iyo codka malaa'igta sare iyo buunka
Ilaah, kolkaasay kuwii Masiixa rumaysnaa oo dhintay horta
soo kici doonaan, 17 dabadeedna kuweenna nool oo hadha
ayaa iyaga kor loola qaadi doonaa daruuraha dhexdooda
inaynu Rabbiga hawada kula kulanno, oo sidaasaynu
Rabbiga weligeen ula joogi doonnaa. 18 Sidaas daraaddeed
hadalladan midkiinba midka kale ha ugu qalbi qabowjiyo.

**5** Walaalayaalow, uma baahnidin in laydiin soo qoro wax
ku saabsan wakhtiyada iyo xilliyada. 2 Waayo, idinka
qudhiinnuba qummaati baad u garanaysaan inay maalinta
Rabbigu u imanayso sida tuug habeen u yimaado. 3 Markay
leeyihiin, Waa nabad iyo salaamad, kolkaasaa filashola'aan
halaaggu u qaban doonaa sida fooshu naag uur leh u
qabato; iyaguna sinaba ugama baxsan doonaan. 4 Laakiinse
idinku, walaalayaalow, gudcur kuma jirtaan in maalintaasu
sida tuug idiin qabato. 5 Waayo, kulligiin waxaad tihiin
carruurta nuurka iyo carruurta maalinnimada, innagu ma nihin
kuwa habeennimada iyo gudcurka; 6 sidaas daraaddeed
yeynan seexan sida kuwa kale yeelaan, laakiinse aan soo
jeedno oo aan feeyignaanno. 7 Waayo, kuwa seexdaa
habeenkay seexdaan, kuwa sakhraamaana habeenkay
sakhraamaan. 8 Laakiin innagoo kuwa maalinta ah aan
feeyignaanno, oo gashanno hubka laabta oo rumaysadka
iyo jacaylka ah iyo koofiyadda rajada badbaadada ah. 9
Waayo, Ilaah inooma uu dooran cadhada, laakiinse wuxuu
inoo doortay inaynu ku badbaadno Rabbigeenna Ciise

Masiix, 10 kan inoo dhintay, inaynu la wada noolaanno isaga,
haddaynu nool nahay iyo haddaynu dhimannoba. 11 Sidaas
daraaddeed midkiinba midka kale ha dhiirrigeliyo oo ha dhiso
sidaad yeelaysaan oo kale. 12 Laakiinse waxaannu idinka
baryaynaa, walaalayaalow, inaad maamuustaan kuwa idinku
dhex hawshooda, oo xagga Rabbiga idinkaga sarreeya
oo idinla taliya; 13 oo aad iyaga aad iyo aad jacayl ugu
derejaysaan shuqulkooda aawadiis. Nabad ku wada jooga.
14 Oo waannu idin waaninaynaa, walaalayaalow, Kuwa si
aan hagaagsanayn u socda la taliya, oo kuwa qalbi jabay
dhiirigeliya, oo kuwa itaalka yar garab siiya, oo dadka oo
dhanna u dulqaata. 15 Iska jira inaan midkiinna midka kale
shar shar uga celin; laakiinse kol kasta wax wanaagsan ha
ugu dadaalo, oo dadka oo dhanna ha ugu dadaalo. 16 Had
iyo goorba farxa. 17 Joogsila'aanna tukada. 18 Wax walbana
mahad ka naqa, waayo, taasu waxay idiin tahay doonista
Ilaah xagga Ciise Masiix. 19 Ruuxa ha deminina. 20 Wax sii
sheegiddana ha quudhsanina. 21 Wax walba tijaabiya, waxa
fiicanna xajiya. 22 Wax kasta oo shar u egna ka fogaada. 23
Ilaaha nabadda qudhiisu quduus ha idinka wada dhigo, oo
ruuxiinna iyo naftiinna iyo jidhkiinna dhammaan ha la wada
ilaaliyo, iyagoo ceeb la' markii Rabbigeenna Ciise Masiix
yimaado. 24 Kan idiin yeedhaa waa aamin, wuuna samayn
doonaa. 25 Walaalayaalow, noo soo duceeya. 26 Walaalaha
oo dhanna dhunkasho quduus ah ku salaama. 27 Rabbigaan
idinku dhaarinayaaye, Warqaddan ha loo akhriyo walaalaha
oo dhan. 28 Nimcada Rabbigeenna Ciise Masiix ha idinla
jirto.

# 2 Tesaloniika

1 Annagoo ah Bawlos iyo Silwanos iyo Timoteyos waxaannu
warqaddan u qoraynaa dadka Tesaloniika kiniisaddooda
oo ku jirta Ilaaha Aabbaha ah iyo Rabbi Ciise Masiix.
2 Nimco ha idinla jirto iyo nabad ka timaada Ilaaha
Aabbaha ah iyo Rabbi Ciise Masiix. 3 Waxaa nagu
waajib ah, walaalayaalow, inaannu mar walba aawadiin
Ilaah ugu mahadnaqno, sida noo eg, maxaa yeelay,
rumaysadkiinnu aad buu u kordhayaa, jacaylka aad kulligiin
isu qabtaanna waa badnaanayaa. 4 Sidaas daraaddeed
waxaannu idinku faannaa kiniisadaha Ilaah dhexdooda,
waana dulqaadashadiinna iyo rumaysadkiinna aad ku dhex
leedihiin silecyada iyo dhibaatooyinka aad u adkaysataan
oo dhan. 5 Taasu waxay muujisaa xukunka xaqa ah ee
Ilaah, in laydinku tiriyo kuwo istaahila boqortooyada Ilaah,
tan aad daraaddeed u xanuunsataan. 6 Waayo, xagga Ilaah
waa xaq inuu dhib ugu abaalgudo kuwa idin dhiba, 7 iyo
inuu kuwiinna la dhibay nala kiin nasiyo markii Rabbi Ciise
samada ka muuqdo, isagoo wata malaa'igaha xooggiisa 8
oo dab ololaya ku jira, oo ka aargudanaya kuwa aan Ilaah
aqoon iyo kuwa aan addeecin injiilka Rabbigeenna Ciise
Masiix. 9 Waxaa lagu ciqaabi doonaa halaag weligiis ah, oo
waxaa laga gooyn doonaa Rabbiga hortiisa iyo ammaanta
xooggiisa, **(aiōnios g166)** 10 markuu yimaado maalintaas in
isaga lagu ammaano quduusiintiisa oo lagula yaabo kuwii
rumaystay oo dhan, maxaa yeelay, markhaatifurkayagii aan
idiin sheegnay waa la rumaystay. 11 Sababtaas daraaddeed
mar walba waannu idiin ducaynaa in Ilaaheen idinka dhigo
kuwa istaahila yeedhistiisa oo uu xoog ku dhammeeyo
doonis kasta oo wanaag ah iyo shuqulka rumaysadka, 12 in
magaca Rabbi Ciise dhexdiinna lagu ammaano, idinkana in
laydinku dhex ammaano isaga, sida nimcada Ilaaheenna iyo
Rabbi Ciise Masiix ay tahay.

2 Xagga Rabbi Ciise Masiix imaatinkiisa iyo ururkeenna
aynu la kulmi doonno isaga, waxaannu idinka baryaynaa,
walaalayaalow, 2 inaan caqligiinnu dhaqso u qasmin ama
aydnaan ku argaggixin ruux, ama hadal, ama warqad
sida mid annagu aannu soo dirnay, sidii iyadoo maalintii
Rabbigu hadda joogto. 3 Sinaba yaan laydiin khiyaanayn,
waayo, maalintaasu ma iman doonto ilamaa horta Ilaah
laga fallaagoobo, oo la muujiyo ninka dembiga oo ah wiilka
halaagga, 4 kan ka geesta ah oo iska sarraysiiya wax alla
waxa Ilaah la yidhaahdo oo dhan iyo waxa la caabudo oo
dhan, oo sidaasuu u dhex fadhiistaa macbudka Ilaah isagoo
qudhiisu Ilaah iska dhigaya. 5 Miyeydnaan xusuusnayn
inaan waxyaalahan idiin sheegay markii aan weli idinla
joogay? 6 Haatan waad garanaysaan waxa joojinaya in
isaga wakhtigiisa la muujiyo. 7 Waayo, qarsoodiga dembigu
haatan waa shaqaynayaa, laakiin kan haddeer joojinayaa
wuxuu joojinayaa ilaa jidka laga qaado isaga. 8 Markaas
waxaa la muujin doonaa sharcilaawaha, kan Rabbi Ciise ku
halligi doono neefta afkiisa, oo imaatinka muuqashadiisa uu
ku baabbi'in doono. 9 Kaas imaatinkiisu waa sida shuqul
Shayddaan oo leh xoog iyo calaamooyin iyo cajaa'ibyo
been ah oo dhan, 10 iyo khiyaanada xaqdarrada oo dhan.
Waxaana leh kuwa lumaya, maxaa yeelay, waxay diideen
inay runta jeclaadaan oo ay sidaas u badbaadaan. 11 Oo
sababtaas daraaddeed ayaa Ilaah ugu soo diraa wax qalad
kaga dhex shaqeeya si ay been u rumaystaan, 12 in kuwa aan
runta rumaysan, laakiinse xaqdarrada ku farxay, kulligood la
wada xukumo. 13 Laakiin waxaa nagu waajib ah inaannu
mar walba aawadiin Ilaah ugu mahadnaqno, walaalayaasha
Rabbigu jecel yahayow, waayo, waxaa Ilaah bilowgii idiin
doortay badbaado ka timaada Ruuxa quduus idinka dhigaya,
iyo rumaysadka runta, 14 tan uu idiinku yeedhay injiilkayaga
inaad heshaan ammaanta Rabbigeenna Ciise Masiix. 15
Sidaas daraaddeed, walaalayaalow, xoogaysta, oo cilmigii
laydin baray xajista, ha noqoto wixii hadal laydinku baray
ama wixii warqaddayada laydinku baraye. 16 Rabbigeenna
Ciise Masiix qudhiisa iyo Ilaaha Aabbeheen ah, kan ina
jeclaaday oo nimcadiisa inagu siiyey dhiirranaanta weligeed
ah iyo rajada wanaagsan, **(aiōnios g166)** 17 qalbiyadiinna ha
dhiirrigeliyo oo ha ku xoogeeyo shuqul iyo hadal walba oo
wanaagsan.

3 Ugu dambaysta, walaalayaalow, waxaan idinku leeyahay,
Noo soo duceeya in ereyga Rabbigu dhaqso u faafo
oo loo ammaano sida dhexdiinna loogu ammaano, 2
oo lanaga badbaadiyo dadka qalloocan oo sharka ah,
waayo, rumaysad lama wada laha. 3 Laakiinse Rabbigu
waa aamin; wuuna idin xoogayn doonaa, sharkana wuu
idinka ilaalin doonaa. 4 Xaggiinnana Rabbiga waannu
aaminsan nahay inaad samaysaan oo aad samayn doontaan
wixii aannu idinku amarno. 5 Rabbigu qalbiyadiinna ha
ku toosiyo jacaylka Ilaah iyo dulqaadashada Masiixa. 6
Hadda walaalayaalow, waxaannu magaca Rabbigeenna
Ciise Masiix idinku amraynaa inaad ka fogaataan walaal
kasta oo si aan hagaagsanayn u socda oo aan ku soconayn
cilmigii ay naga heleen. 7 Waayo, idinka qudhiinnuba waad
garanaysaan sida idinku waajibka ah inaad nagu dayataan;
waayo, si aan hagaagsanayn uma aannu socon markaannu
idin dhex joognay. 8 Ninnana kama aannu cunin kibis aannan

wax ka bixin, laakiin dhib iyo daal ayaannu ku shaqaysannay
habeen iyo maalinba inaannan midkiinna culaysin; 9 mana
aha inaannan amar u lahayn, laakiinse waa inaannu masaal
idiin noqonno oo aad nagu dayataan. 10 Waayo, xataa
markaannu idinla joognay, waxaannu idinku amarnay, Mid
hadduusan doonayn inuu shaqeeyo yuusan waxba cunin. 11
Laakiin waxaannu maqalnay inay idin dhex joogaan kuwo
si aan hagaagsanayn u socda oo aan innaba shaqayn,
laakiin axwaalka dadka kale faraggeliya. 12 Kuwa caynkaas
ah waxaannu Rabbi Ciise Masiix ku amraynaa oo ku
waaninaynaa inay xasilloonaan ku shaqaystaan oo kibistooda
cunaan. 13 Idinkuse, walaalayaalow, wanaagfallidda ha
ka qalbi jabina. 14 Haddii nin addeeci waayo waxaannu
warqaddan ku qornay, ninkaas iska jira oo ha raacina si uu
isugu yaxyaxo. 15 Weliba sida cadow ha ula macaamiloonina,
laakiin sida walaalkiin u waaniya. 16 Haddaba Rabbiga
nabadda qudhiisu mar walba si kasta nabad ha idiin
siiyo. Rabbigu kulligiin ha idinla jiro. 17 Anigoo Bawlos ah
ayaan salaantan gacantayda ku qorayaa; waana u calaamo
warqad kasta oo tayda ah. Sidaasaan u qoraa. 18 Nimcada
Rabbigeenna Ciise Masiix ha idinla jirto kulligiin.

# 1 Timoteyos

**1** Anigoo Bawlos ah oo rasuulkii Ciise Masiix ku ah
amarka Ilaaha Badbaadiyeheenna ah iyo Ciise Masiix oo
rajadeenna ah, 2 waxaan warqaddan u qorayaa Timoteyos oo
xagga iimaanka ku ah wiilkayga runta ah. Nimco iyo naxariis
iyo nabadu ha kaaga yimaadeen Ilaaha Aabbaha ah iyo
Rabbigeenna Ciise Masiix. 3 Sidaan kugu waaniyey markaan
Makedoniya tegayay ayaan haatanna kugu waaninayaa
inaad Efesos sii joogtid oo aad kuwo ku amartid inayan cilmi
kale dadka barin, 4 ama ayan dhegaysanin sheekooyin iyo
abtirsiinyada aan dhammaadka lahayn oo keena su'aalo
intay hor marin lahaayeen talada Ilaah oo rumaysadka ku
jirta. 5 Laakiin amarka dhammaadkiisu waa jacayl ka soo
baxa qalbi daahir ah iyo niyo wanaagsan iyo rumaysad aan
labaweji lahayn. 6 Waxyaalahan qaar baa seegay, oo waxay
ku leexdeen hadal aan micne lahayn, 7 oo waxay doonayaan
inay noqdaan macallimiinta sharciga in kastoo ayan garanayn
waxay yidhaahdaan ama waxay ku xaqiiqeeyaan. 8 Waxaynu
og nahay in sharcigu wanaagsan yahay haddii loo isticmaalo
si sharciga ku qumman. 9 Sidaynu u og nahay, sharciga
looma samayn nin xaq ah, laakiin waxaa loo sameeyey
sharcilaawayaasha, iyo caasiyiinta, iyo cibaadalaawayaasha,
iyo dembilayaasha, iyo kuwa aan quduuska ahayn, iyo kuwa
nijaasta ah, iyo kuwa aabbahood dila, iyo kuwa hooyadood
dila, iyo gacankudhiiglayaasha, 10 iyo kuwa sinaysta, iyo
khaniisiinta, iyo kuwa dadka xada, iyo beenlowyada, iyo
kuwa beenta ku dhaarta, iyo hadday jiraan wax kaleeto
oo ka gees ah cilmiga runta ah, 11 oo ah sida injiilka
ammaanta Ilaaha barakada leh oo laygu ammaaneeyey.
12 Waxaan ku mahadnaqayaa kan xoogga i siiyey oo ah
Rabbigeenna Ciise Masiix, waayo, wuxuu igu tiriyey mid
aamin ah intuu hawshiisa ii doortay, 13 in kastoo aan hore u
ahaan jiray mid dadka caaya oo silciya, oo dhiba, laakiin
waa la ii naxariistay, waayo, aqoonla'aan baan ku sameeyey,
anigoo aan rumaysanayn. 14 Nimcada Rabbigeenna waxay
aad iyo aad ula badatay rumaysadka iyo jacaylka ku jira
Ciise Masiix. 15 Hadalkanu waa run, waana mid istaahila
in la wada aqbalo, in Ciise Masiix dunida u yimid inuu
badbaadiyo dembilayaasha anoo ah kan ugu daran. 16
Laakiin sababtaas daraaddeed waa la ii naxariistay in, anigoo
ah kan ugu daran, Ciise Masiix iga muujiyo dulqaadashadiisa
oo dhan, inaan masaal u noqdo kuwa hadda dabadeed isaga
rumaysan doona inay nolol weligeed ah helaan. **(aiōnios g166)**
17 Boqorka daa'imiska ah, oo aan dhiman karin, oo aan la
arki karin, oo ah Ilaaha keligiis ah, maamuus iyo ammaanu
ha u ahaadeen weligiis iyo weligiis. Aamiin. **(aiōn g165)** 18
Wiilkaygii Timoteyosow, waxaan kugu ammaanaynayaa
amarkan oo ah sidii waxyaalihii hore laguugu sheegay, inaad
iyaga dagaal wanaagsan ku dagaallantid, 19 adigoo haysta
iimaan iyo qalbi wanaagsan. Waxyaalahaas dadka qaarkood
way iska tuureen, oo waxay iimaankooda ka dhigeen sida
doonni burburtay. 20 Waxaana ka mid ah Humenayos iyo
Aleksanderos, oo aan Shayddaan u dhiibay si ay u bartaan
inayan wax caayin.

**2** Sidaas daraaddeed ugu horraysta waxaan kugu
waaninayaa inaad Ilaah u baridid, oo aad u tukatid, oo
aad u ducaysid, oo aad u mahadnaqdid dadka oo dhan,
2 khusuusan boqorrada iyo kuwa amarka lehba, inaynu
nolol xasilloon oo nabdaysan ku noolaanno, innagoo si
walba cibaado iyo maamuus u leh. 3 Taasu way wanaagsan
tahay, waana mid Ilaaha Badbaadiyeheenna ahu aqbali
karo. 4 Wuxuu doonayaa in dadka oo dhammu badbaado
oo ay runta gartaan. 5 Waayo, waxaa jira Ilaah keliya iyo
dhexdhexaadiye keliya oo u dhexeeya Ilaah iyo dadka,
waana ninka Ciise Masiix ah, 6 oo naftiisii dadka oo dhan
furashadooda u bixiyey, oo wakhtigiisii qummanaa loo
markhaati furay. 7 Taas daraaddeed baa layga dhigay inaan
noqdo mid wax wacdiya oo rasuul ah oo macallin dadka
aan Yuhuudda ahayn ugu ah iimaan iyo run. Taasu waa
runtay, oo been sheegi maayo. 8 Taas daraaddeed waxaan
doonayaa in raggu meel walba ku tukado iyagoo gacmo
quduus ah kor u qaadaya oo aan cadho iyo muran lahayn. 9
Sidaas oo kalena naaguhu waa inay, iyagoo xishoonaya oo
digtoon, isku sharraxaan dhar qof xishood leh ku habboon,
oo ayan isku sharraxin timo tidcan, iyo dahab ama luul ama
dhar qaali ah. 10 Laakiinse ha isku sharraxeen shuqullo
wanaagsan oo u eg dumarka cibaadada qira. 11 Naagtu
aamusnaan wax ha ku barato iyadoo isdambaysiinaysa. 12
Laakiin naagna u fasixi maayo inay nin wax barto ama ay ka
xukun sarrayso, inay aamusnaato mooyaane. 13 Waayo,
markii hore Aadan baa la sameeyey, dabadeedna Xaawa.
14 Aadanna lama khiyaanayn, laakiin naagtii baa inta la
khiyaaneeyey waxay noqotay mid xadgudubtay. 15 Laakiinse
waxay ku badbaadi doontaa carruurdhalidda, hadday ku
sii socdaan rumaysad iyo jacayl iyo quduusnaan iyagoo
digtoon.

**3** Hadalku waa run, Haddii nin doonayo shuqulka
hoggaamiyaha kiniisadda, shuqul wanaagsan buu
doonayaa. 2 Sidaas daraaddeed hoggaamiyaha kiniisaddu
waa inuu ahaado mid aan ceeb lahayn, oo naag keliya
qaba, oo feeyigan, oo digtoon, oo sharaf leh, oo martida
soo dhoweeya, oo ku wanaagsan waxbaridda; 3 oo uusan

sakhraan noqon, oo uusan gacan fududaan, laakiin waa inuu
noqdo mid tudhid badan, oo uusan ilaaq lahayn, oo uusan
lacag jeclayn. 4 Waa inuu ahaado mid gurgiisa si wanaagsan
ugu taliya, oo carruurtiisu ka dambeeyaan oo maamuusaan.
5 Laakiin nin hadduusan garanayn si uu gurigiisa ugu taliyo,
sidee buu kiniisadda Ilaah u xanaanayn doonaa? 6 Waa
inuusan ahaan mid dhowaan rumaystay, waaba intaasoo
intuu kibro uu Ibliiska xukunkiisa ku dhacaaye. 7 Weliba waa
inuu markhaati wanaagsan ka helo kuwa dibadda ah, waaba
intaasoo uu ku dhacaa cay iyo dabinka Ibliiska. 8 Sidaas oo
kalena caawiyayaasha kiniisaddu waa inay ahaadaan dad la
maamuuso oo ayan noqon laba-hadallayaal, oo ayan khamri
badan cabbin, oo ayan faa'iidada ceebta ah jeclaan. 9 Waa
inay qarsoodiga iimaanka qalbi daahir ah ku haystaan. 10
Kuwaas marka hore ha la tijaabiyo, dabadeedna sida iyagoo
ah caawiyayaasha kiniisadda ha u adeegeen hadday eed la'
yihiin. 11 Sidaas oo kale dumarkuna waa inay digtoonaadaan
oo ayan ahaan kuwa wax xanta. Waa inay feeyignaadaan,
oo ay wax walba aamin ku ahaadaan. 12 Caawiyayaasha
kiniisaddu mid kastaaba naag keliya ha guursado, hana
noqdeen kuwo si wanaagsan ugu talinaya carruurtooda iyo
guryahooda. 13 Waayo, kuwa sida iyagoo ah caawiyayaasha
kiniisadda si wanaagsan ugu adeega, waxay nafsaddooda
u helaan derejo wanaagsan iyo dhiirranaan badan oo
ay iimaanka Ciise Masiix ku dhiirran yihiin. 14 Waxaan
rajaynayaa inaan dhowaan kuu imaado, laakiin waxaan
waxyaalahan kuugu soo qorayaa, 15 in, haddii aan wax
badan raago, aad ogaato sida waajibka ah oo loogu camal
fali lahaa guriga Ilaah dhexdiisa, oo ah kiniisadda Ilaaha nool
iyo tiirka iyo aasaaska runtaa. 16 Oo muranla'aan qarsoodiga
cibaadadu waa weyn yahay. Isaga jidh baa lagu muujiyey, oo
ruux baa xaq laga caddeeyey, malaa'iguhuna way arkeen,
quruumahana waa laga dhex wacdiyey, dunidana waa laga
rumaystay, ammaanna kor baa loogu qaaday.

4 Laakiin Ruuxu bayaan buu u sheegayaa in wakhtiga
ugu dambaysta qaar ka fogaan doono iimaanka, iyagoo
dhegaysanaya ruuxaxa khiyaaneeya iyo cilmiyada jinniyada,
2 oo waxay kaga fogaan doonaan labawejiilenimada dadka
beenta ku hadla oo qalbigooda la gubay sida isagoo bir
kulul lagu dhejiyey. 3 Waxay diidaan in la guursado, oo
amraan in laga fogaado cuntooyinka Ilaah u abuuray in kuwa
rumaysta oo runta yaqaanu mahadnaqid ku aqbalaan. 4
Waayo, wax kasta oo Ilaah abuuray wuu wanaagsan yahay,
waana inaan waxba la diidin haddii mahadnaqid lagu aqbalo,
5 waayo, waxaa quduus lagaga dhigaa ereyga Ilaah iyo
ducada. 6 Haddaad walaalaha waxyaalahan xusuusisid
waxaad ahaan doontaa Ciise Masiix midiidinkiisa wanaagsan,
adigoo hadallada iimaanka iyo cilmiga wanaagsan oo aad
raacday ku xoogaysanaya. 7 Laakiin ka fogow sheekooyinka
habraha oo nijaasta ah, oo nafsaddaada bar cibaadaysiga,
8 waayo, jidhka waxbariddiisu wax yar bay tartaa, laakiinse
cibaadaysigu si walba waxtar buu u leeyahay isagoo ballan
u leh nolosha haatan joogta iyo tan imanaysaba. 9 Hadalku
waa run, waana mid istaahila in la wada aqbalo. 10 Sababtan
daraaddeed waannu u hawshoonnaa oo u dadaalnaa,
maxaa yeelay, waxaannu rajo ku leennahay Ilaaha nool
oo Badbaadiyaha u ah dadka oo dhan, khusuusan kuwa
rumaysan. 11 Waxyaalahan dadka ku amar oo bar. 12 Ninna
yuusan quudhsan dhallinyaronimadaada, laakiinse kuwa
rumaystay masaal ugu noqo xagga hadalka, iyo xagga
dabiicadda, iyo xagga jacaylka, iyo xagga rumaysadka,
iyo xagga daahirsanaantaba. 13 Ilaa aan imaado, akhriska
iyo waaninta iyo waxbaridda u digtoonow. 14 Ha dayicin
hibada aad haysatid oo lagugu siiyey waxyaalihii laguu sii
sheegay markii waayeelladu gacmahooda ku saareen. 15
Waxyaalahan ku dadaal, oo nafsaddaada oo dhan u go' in
horumarkaagu dadka oo dhan u muuqdo. 16 Nafsaddaada
iyo cilmigaagaba u digtoonow. Oo waxyaalahan ku sii
soco, waayo, haddaad yeeshid, nafsaddaada iyo kuwa ku
dhegaystaba waad badbaadin doontaa.

5 Nin waayeel ah ha canaanan, laakiin u waani sida aabbe
oo kale; dhallinyaradana u waani sida walaalo oo kale;
2 habrahana sida hooyooyin oo kale u waani, naagaha
dhallintayarna sida walaalo oo kale, adigoo daahir ah. 3
Maamuus carmallada runta ah oo nimankoodii ka dhinteen,
4 laakiin haddii naag carmal ahu carruur leedahay ama
carruurteedu ay carruur leedahay, iyagu marka hore ha
barteen inay dadkooda si cibaado leh kula macaamiloodaan,
waalidkoodna u cawilceliyaan, waayo taasu way wanaagsan
tahay, waana mid Ilaah aqbali karo. 5 Waayo, tii carmal
run ah oo cidlootay, waxay rajo ku leedahay Ilaah, habeen
iyo maalinna baryada iyo tukashada way sii waddaa. 6
Laakiin tii raaxaysi u noolaataa waa meyd intay nooshahay.
7 Waxyaalahan ku amar inay ceeb la'aadaan. 8 Laakiin qof
hadduusan dadkiisa dhaqaalayn, khusuusan kuwa gurigiisa
jooga, kaasu iimaankuu ka hor yimid, wuuna ka sii liitaa mid
aan rumaysanayn. 9 Ha la qoro carmal aan lixdan sannadood
ka yarayn oo nin keliya naag u ahaan jirtay, 10 oo loogu
marag furay inay shuqullo wanaagsan samaysay, hadday
carruur korisay, hadday shisheeyaha marti soori jirtay, hadday
quduusiinta cagaha u maydhay, hadday kuwii dhibaataysnaa
u gargaartay, hadday shuqul kasta oo wanaagsan aad

ugu dadaashay. 11 Laakiinse carmallada dhallintayar diid,
waayo, markay qooqaan ayay ka jeestaan Masiixa, oo
waxay doonayaan inay guursadaan. 12 Iimaankoodii hore
way naceen, oo sidaas daraaddeed waa la xukumay. 13
Waxay kaloo weliba bartaan inay caajisiin noqdaan, iyagoo
iska wareegaya oo guriba guri uga baxaya; caajisiin oo
keliyana ma ahaye, weliba way warsheeko badan yihiin,
oo axwaalka dadka kalena way faraggeliyaan, iyagoo ku
hadlaya waxyaalo aan waajib ku ahayn. 14 Haddaba waxaan
doonayaa inay carmallada dhallintayaru guursadaan, oo
carruur dhalaan, oo gurigooda u taliyaan, oo ayan cadowga
isu jebin inuu caayo. 15 Waayo, hadda ka hor qaar baa
xagga Shayddaanka u leexday. 16 Haddii naag rumaysanu
ay leedahay carmallo ha u gargaarto iyaga, oo kiniisadda
yaan la culaysin, si ay u gargaarto kuwa carmallada runta ah.
17 Waayeellada si wanaagsan wax ugu taliya ha lagu tiriyo
kuwo istaahila in labanlaab loo maamuuso, khusuusan kuwa
ku hawshooda waxwacdinta iyo waxbaridda. 18 Waayo,
Qorniinku wuxuu leeyahay, Waa inaadan dibiga af xidhin
markuu sarreenka burburinayo. Wuxuu kaloo leeyahay,
Shaqaalahu waa istaahilaa abaalgudkiisa. 19 Nin waayeel ah
ashtako ha ku qaadin, laba ama saddex qof oo ku markhaati
fura mooyaane. 20 Kuwa dembaaba inta kale oo dhan
hortooda ku canaano in kuwa kalena ay cabsadaan. 21
Waxaan Ilaah iyo Ciise Masiix iyo malaa'igaha la doortay
hortooda kugu waaninayaa inaad waxyaalahan ku dhawrtid
eexashola'aan, oo aadan waxba samayn adoo dadka kala
jeclaanaya. 22 Ninna gacmaha degdeg ha u saarin, dad
kale dembiyadoodana ha ka qayb gelin. Nafsaddaada
daahirsanaan ku dhawr. 23 Laakiinse hadda ka dib biyo oo
keliya ha cabbin, illowse waxoogaa yar oo khamri ah u cab
calooshaada iyo cudurradaada mararka badan kugu soo
noqnoqda daraaddood. 24 Dadka qarkood dembiyadoodu
waa bayaan, oo waxay u hor marayaan xukunka, dadka
qaarkoodna kuwoodu way daba socdaan. 25 Sidaas oo
kalena waxaa jira shuqullo wanaagsan oo bayaan ah, kuwa
aan caynkaas ahaynna lama qarin karo.

**6** In alla intii addoommo ah oo ka hoosaysa harqoodka
addoonnimada, sayidyadooda ha ku tiriyeen kuwo
maamuus oo dhan istaahila, si aan magaca Ilaah iyo cilmiga
loo caayin. 2 Kuwii sayidyo rumaysan lahu yaanay quudhsan,
maxaa yeelay, waa walaalo; laakiin ha u adeegeen intay
quudhsan lahaayeen, maxaa yeelay, kuwa shuqulkooda
wanaagsan ka faa'iidaa waa kuwa rumaysan oo la jecel
yahay. Dadka waxyaalahan bar oo ku waani. 3 Haddii nin
dadka cilmi kale baro oo uusan u oggolaan hadalka runta ah
oo Rabbigeenna Ciise Masiix iyo cilmiga raacsan cibaadada,
4 kaasu waa kibirsan yahay, oo waxba garan maayo.
Wuxuuna u jeellan yahay su'aalo iyo hadal-iskuqabasho,
waxaana ka yimaada hinaaso iyo dirir iyo cay iyo tuhun xun,
5 iyo murannada dadka maankoodu kharribmay oo runta
waayey, iyagoo u malaynaya in cibaadadu tahay wax faa'iido
laga helo. 6 Laakiin cibaadadu waa faa'iido weyn markii
waxa la haysto raalli lagu yahay; 7 waayo, dunida waxba ma
aynu keenin, waxbana ka qaadan kari mayno. 8 Laakiinse
haddaynu haysanno dhar iyo dhuuni, way inagu filnaan
doonaan. 9 Laakiin kuwa doonaya inay taajir noqdaan,
waxay ku dhacaan duufsasho iyo dabin iyo damacyo badan
oo nacasnimo ah waxyeellona leh, oo dadka ku hafiya
baabbi'in iyo halaag. 10 Waayo, jacaylka lacagtu waa
xididka xumaatooyinka oo dhan, oo qaar intay higsanayeen
ayay iimaankii ka ambadeen, oo waxaa muday tiiraanyo
badan. 11 Laakiinse adigu, nin yahow Ilaah, waxyaalahan
ka carar; oo raac xaqnimada, iyo cibaadada, iyo iimaanka,
iyo jacaylka, iyo dulqaadashada, iyo qabownimada. 12
Dagaalka wanaagsan oo iimaanka dagaallan, oo qabso
nolosha weligeed ah, oo laguugu yeedhay, oo aad qirashada
wanaagsan ku hor qiratay markhaatiyaal badan. **(aiōnios
g166)** 13 Ilaah hortiis kan wax kasta nooleeya, iyo Ciise
Masiix hortiis, kan Bontiyos Bilaatos hortiisa qirashada
wanaagsan ku qirtay, waxaan kugu amrayaa 14 inaad
amarka ku xajisid iinla'aan iyo ceebla'aan ilaa Rabbigeenna
Ciise Masiix muuqdo, 15 muuqashadaas uu wakhtigiisa
muujin doono, kan ammaanta leh oo keligiis xoogga leh, oo
ah Boqorka boqorrada iyo Sayidka sayidyada, 16 kan keligiis
aan dhimanayn, oo ku dhex jira nuurka aan loo dhowaan
karin, oo aan ninna arkin, lana arki karin; isagu ha lahaado
ciso iyo itaal weligiis. Aamiin. **(aiōnios g166)** 17 Kuwa dunidatan
haatan la joogo hodanka ku ah waani inayan iskibrin oo
ayan maalka aan la hubin isku hallayn, laakiinse ay isku
halleeyaan Ilaaha wax kasta si deeqsinimo ah inoo siiya si
aynu ugu raaxaysanno. **(aiōn g165)** 18 Oo waani inay wax san
sameeyaan, oo ay shuqullo wanaagsan hodan ku ahaadaan,
oo ay deeqsi ahaadaan, oo ay dadka kale wax siiyaan, 19
iyagoo wakhtiga imanaya u dhiganaya aasaas wanaagsan,
inay nolosha runta ah qabsadaan. 20 Timoteyosow, wixii
laguu dhiibay ilaali, oo ka leexo hadalka aan micnaha lahayn
oo nijaasta ah iyo muranka aqoonta beenta ah, 21 oo qaar
qirashadeeda aawadeed iimaanka ku gafeen. Nimco ha
idinla jirto.

# 2 Timoteyos

**1** Anigoo Bawlos ah oo rasuulkii Ciise Masiix ku ah doonista Ilaah, sida uu leeyahay ballanka nolosha Ciise Masiix ku jirta, **2** waxaan warqaddan u qorayaa Timoteyos oo ah wiilkayga aan jeclahay. Nimco iyo naxariis iyo nabadu ha kaaga yimaadeen Ilaaha Aabbaha ah iyo Rabbigeenna Ciise Masiix. **3** Waxaan ku mahadnaqayaa Ilaaha aan qalbi daahir ah ugu adeego siday awowayaashay ugu adeegi jireen, anigoo habeen iyo maalinba joogsila'aan baryadayda kugu xusuusanaya. **4** Markaan ilmadaadii xusuusto waxaan aad u doonayaa inaan ku arko, inaan aad u farxo. **5** Waxaan xusuustay rumaysadka aan labada weji lahayn oo kugu jira, oo markii horena ku jiri jiray ayeeyadaa Lowis iyo hooyadaa Yunikee, adigana waan kugu aaminsanahay inuu kugu jiro. **6** Taas daraaddeed waxaan ku xusuusinayaa inaad kicisid hadiyadda Ilaah ee kugu jirta oo kuugu timid gacmosaariddaydii. **7** Waayo, Ilaah inama uu siin ruuxa cabsida, laakiinse wuxuu ina siiyey ruuxa xoogga iyo jacaylka iyo miyirka. **8** Sidaas daraaddeed ha ka xishoon u markhaatifuridda Rabbigeenna ama aniga oo isaga maxbuus u ah, laakiinse dhibaatada injiilka kaga qayb qaado xoogga Ilaah. **9** Ilaah waa kan ina badbaadiyey oo yeedhid quduus ah inoogu yeedhay, mana aha xagga shuqulladeenna, laakiinse waa xagga qasdigiisa iyo nimcadiisa, oo uu waayadii hore hortood inagu siiyey Ciise Masiix, **(aiōnios g166)** **10** laakiinse haatan lagu muujiyey muuqashada Badbaadiyeheenna Ciise Masiix, kaas oo dhimashada baabbi'iyey, oo nolosha iyo dhimashola'aanta iftiinka ugu soo saaray xagga injiilka, **11** kaas oo laygu doortay inaan noqdo mid wax wacdiya iyo rasuul iyo macallinba. **12** Sababtaas aawadeed ayaan waxyaalahan ugu xanuunsanayaa; laakiinse ka xishoon maayo, waayo, waan garanayaa kan aan rumaystay, oo waxaan aaminsanahay inuu awoodo inuu dhawro wixii aan ku ammaanaystay ilaa maalintaas. **13** Masaalkii erayada runta ahaa ee aad iga maqasheen ku xaji rumaysadka iyo jacaylka Ciise Masiix ku jira. **14** Ammaanadii wanaagsanayd ee laguu dhiibay ku dhawr Ruuxa Quduuska ah oo inagu dhex jira. **15** Waad og tahay in kuwii Aasiya joogay oo dhammu ay iga leexdeen, waxaana ka mid ah Fugelos iyo Hermogenees. **16** Rabbiga ha u naxariisto reerkii Oneesiforos; waayo, marar badan ayuu i nasiyey, kamana xishoon silsiladdayda. **17** Laakiinse markuu Rooma joogay wuxuu ku dadaalay inuu i daydayo, wuuna i helay. **18** Rabbigu maalintaas ha u naxariisto. Oo adigu aad baad u taqaan intuu waxyaalo ka adeegay Efesos.

**2** Haddaba, wiilkaygiiyow, ku xoogayso nimcada Ciise Masiix ku jirta. **2** Oo waxyaalihii aad markhaatiyaal badan dhexdood igaga maqashay ku ammaanee niman aamin ah oo awooda inay kuwa kaleeto baraan. **3** Dhibaato ka qayb qaado sida askari wanaagsan oo Ciise Masiix. **4** Nin askari ahi, si uu uga farxiyo kii isaga askari ahaanta u qortay, iskuma murgiyo axwaasha noloshan, **5** weliba haddii nin galo cayaaraha loo loollamo, taaj looma saaro hadduusan sida qaynuunka ah u loollamin. **6** Ninka beerta leh ee hawshoodaa waa inuu ahaadaa kan ugu horreeya oo midhaha ka qayb qaata. **7** Waxaan leeyahay ka fiirso, waayo, Rabbigu wuxuu ku siin doonaa wax walba garashadooda. **8** Bal xusuuso Ciise Masiix, kan kuwii dhintay ka soo sara kacay, oo Daa'uud ka soo farcamay, sida uu leeyahay injiilka aan idinku wacdiyo, **9** kan aan u dhibtoodo oo aan u xidhnahay sidii mid wax xun falay; laakiinse erayga Ilaah ma xidhna. **10** Haddaba wax walba waxaan ugu adkaystaa kuwa la doortay aawadood inay iyana helaan badbaadada ammaanta weligeeda leh oo ku jirta Ciise Masiix. **(aiōnios g166)** **11** Hadalkanu waa dhab, Haddii aynu isaga la dhimannay, dee haddana waynu la noolaan doonnaa, **12** haddii aynu adkaysanno, dee haddana wax baynu la xukumi doonnaa; haddii aynu isaga inkirnona, dee isna wuu ina diidi doonaa; **13** haddii aynu nahay aaminlaawayaal, isagu weli waa aamin; waayo, isagu isma burin karo. **14** Waxyaalahan iyaga xusuusi oo Rabbiga hortiisa ku amar inayan hadal ku murmin, waayo, kaasu faa'iido ma leh, laakiinse kuwa maqla ayuu sii kharribaa. **15** Ku dadaal inaad nafsaddaada loo bogay Ilaah siisid, adigoo ah shaqeeye aan dadka ka xishoonin, oo hadalka runta ah si hagaagsan u wada. **16** Laakiinse ka fogow hadalka aan micnaha lahayn, oo nijaasta ah, waayo, kuwaas waxay hore u sii wadi doonaan cibaadola'aanta, **17** oo hadalkoodu sida waraabowgu u faafo ayuu u sii faafi doonaa; iyaga waxaa ka mid ah Humenayos iyo Fileetos, **18** oo ah kuwa xagga runta ka gefay iyagoo leh, Sarakicidda waa horaa la soo dhaafay, oo qaar bay iimaanka ka halleeyaan. **19** Habase yeeshee aasaaskii adkaa oo Ilaah dhigay wuu taagan yahay, isagoo leh sumaddan, Rabbigu wuu yaqaan kuwiisa; oo mid kasta oo magaca Rabbiga soo qaada xaqnimola'aanta ha ka tago. **20** Haddaba kuma jiraan guri weyn weelal dahab iyo lacag keliya ahi, laakiinse waxaa kaloo yaal kuwo qoryo iyo dhoobo ah; oo qaarkoodna wax sharaf leh ayay taraan, qaarna wax aan sharaf lahayn. **21** Sidaas daraaddeed haddii nin iska daahirsho kuwan, kaasu wuxuu ahaan doonaa weel sharaf leh, oo quduus laga dhigay, oo sayidka wax u tara, oo shuqul kasta oo wanaagsan loo diyaariyey. **22** Haddaba ka fogow damacyada xunxun ee dhallinyaronimada, laakiinse

xaqnimo, iyo rumaysad, iyo jacayl, iyo nabad la raac kuwa
Rabbiga uga yeedha qalbi daahir ah. 23 Iska diid su'aalaha
nacasnimada iyo jaahilnimada ah, adigoo og inay dagaallo
dhalaan. 24 Addoonka Rabbigu waa inuusan ilaaqtamin,
laakiin waa inuu ahaado mid dadka u wada roon, oo
waxbaridda ku wanaagsan, oo dulqaadasho badan, 25 oo si
qabow u edbiya kuwa isaga diida; mindhaa Ilaah waa siin
doonaa toobadkeenid inay runtay gartaan, 26 oo ay dabinka
Ibliiska ka baxsadaan, iyagoo lagu qabtay si ay muraadkiisa
u yeelaan.

3 Bal tan ogow, maalmaha ugu dambeeya waxaa iman
doona wakhtiyo dhib badan. 2 Maxaa yeelay, dadku
waxay ahaan doonaan kuwo naftooda jecel, iyo kuwo lacag
jecel, iyo kuwo faan badan, iyo kuwo kibir badan, iyo kuwo
caytan badan, iyo kuwo waalidkood caasi ku ah, iyo kuwo
aan mahadnaqin, iyo kuwo aan quduus ahayn, 3 iyo kuwo
aan kalgacayl lahayn, iyo kuwo aan heshiis doonaynin, iyo
kuwo wax xanta, iyo kuwo aan iscelin karin, iyo kuwo ba'an,
iyo kuwo aan wanaagga jeclayn, 4 iyo kuwo gacangeliyayaal
ah, iyo kuwo haad ah, iyo kuwo isla weyn, iyo kuwa
raaxaysi jecel intii ay Ilaah jeclaan lahaayeen. 5 Iyagu waxay
haystaan u-ekaanta cibaadaysiga, laakiinse xooggiisay
diidaan; kuwaas ka leexo. 6 Waayo, kuwaas waxaa ka mid
ah kuwa guryaha gala, oo ambiya naagaha caqliga la' oo
dembiyadu ku raran yihiin, oo damacyada kala duduwanu
ay la tageen, 7 oo weligood wax baranaya, laakiinse aan
marnaba awoodin inay runta gartaan. 8 Siday Yannees iyo
Yambarees isu hor taageen Muuse, saas oo kalay kuwanuna
runta isu hor taagaan; waana niman maankoodu kharribmay
oo xagga iimaankana laga nacay. 9 Laakiinse hore uma
socon doonaan, waayo, nacasnimadoodu bayaan bay dadka
oo dhan u noqon doontaa sidii ay kuwaas toodiiba u
noqotay. 10 Laakiinse adigu waxaad raacday waxbariddayda,
iyo socodkayga, iyo qasdigayga, iyo rumaysadkayga, iyo
dulqaadashadayda, iyo jacaylkayga, iyo samirkayga, 11 iyo
silecyadayda, iyo xanuunsigayga. Waxyaalihii xunxumaa
ee igu dhacay markaan Antiyokh iyo Ikoniyon iyo Lustara
joogay! Silecyadii badnaa ee aan u adkaystay! Oo kulligood
Rabbigaa iga samatabbixiyey. 12 Runtii, kulli inta doonaysa
inay si cibaado leh Ciise Masiix ugu noolaadaan waa la silcin
doonaa. 13 Laakiinse dadka sharka leh iyo khaa'innadu aad
iyo aad bay u sii xumaan doonaan, iyagoo wax khiyaaneeya,
lana khiyaaneeyo. 14 Laakiinse adigu ku sii soco waxyaalihii
aad baratay oo aad hubsatay, adigoo garanaya kuwii aad
ka baratay; 15 tan iyo yaraantaadii waxaad garanaysay
qorniinka quduuska ah oo badbaadada kugu garansiin kara
rumaysadka Ciise Masiix lagu rumaysto. 16 Qorniin kastaa
wuxuu ku ahaaday Ruuxa Ilaah oo waxtar buu u leeyahay
waxbaridda, iyo canaanashada, iyo hagaajinta, iyo edbinta
xagga xaqnimada; 17 in ninka Ilaah u ahaado mid dhan oo
aad loogu diyaariyey shuqul kasta oo wanaagsan.

4 Waxaan kugu amrayaa Ilaah hortiis iyo Ciise Masiix
oo xukumi doona kuwa nool iyo kuwii dhintayba
hortiisa, oo waxaan kaloo kugu amrayaa muuqashadiisa
iyo boqortooyadiisa, 2 inaad hadalka dadka ku wacdido.
Wakhti wanaagsan iyo wakhti xunba ku dadaal, oo canaano,
oo hagaaji, oo waani, adigoo dulqaadanaya oo wax
baraya. 3 Waayo, waxaa iman doona wakhti aan dadku u
adkaysan doonin cilmiga runta ah, laakiinse iyagoo dheguhu
cuncunayaan ayay waxay u urursan doonaan macallimiin
siday damcaan; 4 oo dhegahooday runta ka leexin doonaan,
oo waxay u jeedin doonaan sheekooyin. 5 Laakiinse adigu
mar kasta digtoonow, oo dhibta u adkayso, oo shuqulka
wacdiyaha qabo, oo adeegiddaada dhammee. 6 Waayo,
haatan allabari ahaan baa lay bixinayaa, oo wakhtigii aan
tegi lahaa waa yimid. 7 Dagaalkii wanaagsanaa waan
dagaallamay, oo tartankii waan dhammeeyey, iimaankiina
waan dhawray. 8 Haddaba waxaa la ii dhigay taajkii
xaqnimada oo Rabbiga ah xaakinka xaqa ahu i siin doono
maalintaas; oo keligayna ima siin doono, laakiin kuwa
muuqashadiisa jecel oo dhanna wuu siin doonaa. 9 Ku
dadaal inaad dhaqso iigu timaadid; 10 waayo, Deemaas
intuu dunidan haatan la joogo jeclaaday ayuu iga tegey,
oo wuxuu aaday Tesaloniika; Kereeskeesna wuxuu aaday
Galatiya; Tiitosna wuxuu aaday Dalmatiya. **(aiōn g165)** 11
Haatan Luukos oo keliya ayaa ila jooga. Markos soo kaxee
oo ha ku soo raaco; waayo, waxtar buu igu leeyahay xagga
adeegidda. 12 Laakiinse Tukhikos waxaan u diray Efesos.
13 Markaad soo kacdid ii soo qaad shuluggayga aan kaga
tegey Karbos oo Taroo'as jooga, buwaagtiina ii soo qaad
khusuusan idiinta wax lagu qoro. 14 Aleksanderos, kii
naxaasta tumi jiray, wax xun oo badan buu ii yeelay; Rabbigu
wuxuu ugu abaalgudi doonaa sidii camalladiisu ahaayeen.
15 Adiguna iska jir isaga, waayo, aad buu hadalkayaga u hor
joogsaday. 16 Isdaafacaaddaydii hore ninna isma kay garab
taagin, laakiinse kulli waa layga wada tegey. Taas yaan
dushooda laga dhigin. 17 Laakiinse Rabbiga ayaa iskay
garab taagay, oo xoog i siiyey, inaan farriinta dadka oo dhan
wada gaadhsiiyo oo ay dadka aan Yuhuudda ahayn wada
maqlaan; oo waxaa layga samatabbixiyey afkii libaaxa. 18 Oo
Rabbiguna wuu iga samatabbixin doonaa shuqul kasta oo
shar ah, oo wuxuu igu nabad gelin doonaa boqortooyadiisa

jannada ah. Isaga ammaanu ha u ahaato weligiis iyo weligiis.
Aamiin. **(aiōn g165)** **19** Igu salaan Bariska iyo Akula iyo reerkii
Oneesiforos. **20** Erastos wuxuu ku hadhay Korintos; laakiinse
Torofimos oo buka ayaan Mileetos uga soo kacay. **21** Ku
dadaal inaad wakhtiga qabowga hortiis ii timaadid. Waxaa ku
soo salaamaya Yubulos iyo Budees iyo Liinos iyo Kalawdiya
iyo walaalaha oo dhan. **22** Rabbigu ruuxaaga ha la jiro.
Nimcona ha kula jirto. Aamiin.

# Tiitos

1 Anigoo Bawlos ah oo Ilaah addoon u ah, Ciise Masiixna
rasuul u ah, siday yihiin iimaanka kuwa Ilaah doortay
iyo aqoonta runta oo ah xagga cibaadada, 2 iyagoo
rajaynaya nolosha weligeed ah oo Ilaaha aan beenta
sheeginu u ballanqaaday waayadii hore hortood, **(aiōnios
g166)** 3 laakiinse wakhtiyadiisii goonida ahaa uu hadalkiisii
ku muujiyey wacdigii laygu ammaaneeyey sida Ilaaha
Badbaadiyeheenna ahu u amray, 4 waxaan warqaddan u
qorayaa Tiitos oo ah wiilkayga runta ah xagga iimaanka
inaga dhexeeya. Nimco iyo nabadu ha kaaga yimaadeen
Ilaaha Aabbaha ah iyo Badbaadiyeheenna Ciise Masiix. 5
Sababtaas daraaddeed ayaan Kereetee kaaga dhex tegey
inaad hagaajisid waxyaalaha hadhay iyo inaad waayeello
magaalo walba ka dooratid sidaan kuugu amray, 6 hadduu
mid waliba yahay nin aan ceeb lahayn, oo naag keliya qaba,
oo leh carruur rumaysan, oo aan rabshad iyo caasinimo lagu
dacwaynin. 7 Waayo, hoggaamiyaha kiniisaddu waa inuu
ceeb la'aado sida wakiilka Ilaah; oo uusan madax adkaan, oo
uusan camal fududaan, oo uusan sakhraan noqon, oo uusan
gacan fududaan, oo uusan faa'iidada ceebta ah jeclaan,
8 laakiinse waa inuu ahaado mid martida soo dhoweeya,
oo wanaag jecel, oo feeyigaan, oo xaq ah, oo quduus ah,
oo iscelin kara; 9 isagoo xajinaya hadalka aaminka ah oo
ah sidii loo baray, inuu awoodo inuu cilmiga runta ah ku
waaniyo oo ku canaanto kuwa muranka miidhan ah. 10
Waayo, waxaa jira caasiyiin badan, iyo kuwa hadal xun ku
hadla, iyo khaa'inno, oo khusuusan waa kuwa gudan. 11
Kuwaas afkooda waa in la xidho, maxaa yeelay, waa kuwa
reero dhan gembiya iyagoo faa'iidada ceebta ah aawadeed
u baraya waxyaalo aan waajib ahayn inay baraan. 12 Mid
iyaga ka mid ahaa oo nebigoodii ahaa ayaa wuxuu yidhi,
Reer Kereetee weligood waa beenaalayaal, iyo dugaag
xun, iyo kuwo cir weyn oo caajisiin ah. 13 Markhaatigaasu
waa run. Sababtaas aawadeed aad u canaano iyaga inay
iimaanka si run ah ugu socdaan 14 iyagoo aan dhegaysanayn
sheekooyinka Yuhuudda iyo amarrada dadka runta ka
leexanaya. 15 Kuwa daahirka ah wax waluba waa u daahir,
laakiin kuwa nijaasaysan oo aan rumaysadka lahayn waxba
daahir uma aha, laakiinse kaskooda iyo niyadooduba waa
nijaasoobeen. 16 Waxay afka ka qirtaan inay Ilaah yaqaaniin,
laakiin camalladooday isaga kaga hor yimaadaan, iyagoo
karaahiyo iyo caasiyiin ah, oo xagga shuqul wanaagsan oo
dhan laga nacay.

2 Laakiinse adigu ku hadal waxyaalaha ku habboon cilmiga
runta ah. 2 Odayaashu waa inay feejignaadaan oo dhug
yeeshaan oo digtoonaadaan oo ay si run ah ugu socdaan
iimaanka iyo jacaylka iyo dulqaadashada. 3 Sidaas oo
kalena habruhu waa inay asluub quduus ah lahaadaan,
oo ayan noqon kuwa wax xanta, oo ayan khamri badan
addoommo u noqon, laakiinse ay noqdaan kuwo wax
wanaagsan dadka bara. 4 Oo waa inay naagaha dhallintayar
baraan inay jeclaadaan nimankooda iyo carruurtooda,
5 oo ay digtoonaadaan, oo ay daahir noqdaan, oo ay
gurigooda ka shaqeeyaan, oo ay wanaagsanaadaan, iyagoo
nimankooda ka dambeeya, si aan ereyga Ilaah loo caayin. 6
Ragga dhallinyarada ahna sidaas oo kale ku waani inay
digtoonaadaan. 7 Wax walba nafsaddaada masaal ahaan u
tus xagga shuqullada wanaagsan; oo cilmigaagana ku tus
qummanaan, iyo dhuglahaan, 8 iyo hadal run ah oo aan
ceeb lahayn, si midka geesta kaa ahu u ceeboobo, oo uusan
u helin wax xun oo uu inaga sheego. 9 Addoommaduna waa
inay sayidyadooda ka dambeeyaan, oo ay wax kasta kaga
farxiyaan, oo ayan la murmin, 10 oo ayan wax ka xadin,
laakiin waa inay aaminnimo wanaagsan oo dhan muujiyaan,
inay si kasta cilmiga Ilaaha Badbaadiyeheenna ah ammaan
ugu soo jiidaan. 11 Waayo, nimcadii Ilaah way muuqatay,
iyadoo badbaado u keenaysa dadka oo dhan, 12 oo ina
baraysa inaynu cibaadola'aanta iyo damacyada dunida
diidno, oo aynu wakhtigan haatan la joogo digtoonaan iyo
xaqnimo iyo cibaado ku noolaanno, **(aiōn g165)** 13 innagoo
sugayna rajada barakaysan iyo muuqashada ammaanta
Ilaaheenna weyn oo ah Badbaadiyeheenna Ciise Masiix.
14 Isagu nafsaddiisuu u bixiyey aawadeen, inuu dembi oo
dhan inaga furto oo uu inaga dhigto dad daahirsan oo uu
isagu leeyahay oo ku dadaalaya shuqullo wanaagsan. 15
Waxyaalahan dadka kula hadal, oo ku waani, oo ku canaano,
adigoo amar oo dhan leh. Oo ninna yuusan ku quudhsan.

3 Xusuusi iyaga inay taliyayaasha iyo kuwa amarka leh ka
dambeeyaan, oo ay dhego nuglaadaan, oo ay shuqul kasta
oo wanaagsan diyaar u ahaadaan, 2 oo ayan ninna caayin oo
noqon kuwa ilaaq badan, laakiinse dadka oo dhan roonaan
iyo qaboobaan ha tuseen. 3 Waayo, innaguba waa baynu
ahayn nacasyo, iyo caasiyiin, iyo kuwa la khiyaaneeyey, iyo
addoommada damacyada xaaraanta ah iyo raaxooyinka
kala duduwan, oo waxaynu ku socon jirnay xumaan iyo
xaasidnimo, oo waxaynu ahaan jirnay kuwo la nebcaaday oo
iyana midba midka kale neceb yahay. 4 Laakiinse markii
raxmaddii Ilaaha Badbaadiyeheenna ah iyo jacaylkii uu
dadka u qabay muuqdeen, 5 ayuu ina badbaadiyey. Inaguma

uu badbaadin shuqullada xaqnimada oo aynu samaynay,
laakiinse naxariistiisa aawadeed wuxuu inagu badbaadiyey
nadiifinta dhalashadii labaad iyo cusboonaysiinta Ruuxa
Quduuska ah,
6 oo uu aad inoogu shubay oo uu inoogu
soo dhiibay Badbaadiyeheenna ah Ciise Masiix;
7 inaynu,
innagoo quduus laynagaga dhigay nimcadiisa, rajada ku
noqonno kuwo nolol weligeed ah dhaxla. **(aiōnios g166)**
8 Hadalkanu waa run, oo xagga waxyaalahan waxaan
doonayaa inaad ku adkaysatid in kuwa Ilaah rumaysanu
ay digtoonaadaan inay shuqullo wanaagsan ku dadaalaan.
Waxyaalahanu way wanaagsan yihiin, dadkana wax bay
u taraan.
9 Laakiin ka fogow su'aalaha nacasnimada ah,
iyo abtirsiinyada, iyo murannada, iyo ilaaqda sharciga ku
saabsan, waayo, waxtar iyo micne toona ma leh.
10 Haddaad
nin bidci ah mar iyo laba waanisid dabadeed ka leexo,
11
adigoo garanaya in ninka caynkaas ahu qalloocan yahay
oo dembaabo isagoo isxukumay.
12 Markaan kuu soo
diro Artemaas ama Tukhikos aad ugu dadaal inaad iigu
timaado Nikobolis, waayo, waxaan goostay inaan xilliga
qabow meeshaas joogi doono.
13 Ku dadaal inaad Seenaas
kan sharciga yaqaan iyo Abolloos soo ambabbixisid si ayan
waxba ugu baahan.
14 Dadkeennuna ha barto inay shuqullo
wanaagsan ugu dadaalaan caawimaadda loo baahan yahay,
inayan kuwo aan midho lahayn noqonin.
15 Kuwa ila jooga
oo dhammu way ku soo salaamayaan. Igu salaan kuwa
iimaanka nagu jecel. Nimco ha idinla wada jirto.

# Filemon

1 Anigoo Bawlos ah oo Ciise Masiix maxbuus u ah, iyo
walaalkeen Timoteyos, waxaannu warqaddan u qoraynaa
Filemon oo ah gacaliyahayaga nala shaqeeya, 2 iyo
walaashayo Afiya, iyo Arkhibbos oo askar nala ah, iyo
kiniisadda gurigaaga ku taal. 3 Nimco ha idinla jirto iyo nabad
ka timaada Ilaaha Aabbeheenna ah iyo Rabbi Ciise Masiix.
4 Had iyo goorba Ilaahay baan kuugu mahadnaqaa, anigoo
baryadayda kugu xusuusanaya, 5 waayo, waxaan maqlay
jacaylka aad quduusiinta oo dhan u qabto iyo rumaysadka
aad Rabbi Ciise ku rumaysato. 6 Oo waxaan baryayaa in
wadaagidda iimaankaagu uu socodsiiyo aqoonta wax kasta
oo wanaagsan oo inoogu jira Masiixa. 7 Waayo, jacaylkaaga
waxaan ku haystay farxad iyo dhiirranaan badan, maxaa
yeelay, qalbiga quduusiinta adaa qabowjiyey, walaalkayow.
8 Sidaas daraaddeed, in kastoo aan Masiixa ku leeyahay
dhiirranaan badan inaan kugu amro waxa kuu eg, 9 haddana
waxaan ka jeclaan lahaa inaan ku baryo jacaylka aawadiis,
anigoo ah duqii Bawlos, maxbuusna Ciise Masiix u ah. 10
Waxaan kuu baryayaa wiilkayga Oneesimos oo aan dhalay
anigoo xabbisan, 11 kii waagii hore aan waxtarka kuu lahaan
jirin, haatanse adiga iyo anigaba wax ina tara. 12 Waan kuu
soo celinayaa, isagoo qalbigayga ah. 13 Waxaan jeclaan
lahaa inaan sii hayo inuu aawadaa iigu adeego inta aan
injiilka u xabbisanahay. 14 Laakiinse ma aanan doonayn
inaan sameeyo wax aadan ila ogayn, inaan wanaaggaagu
noqon dirqi laakiinse uu noqdo ikhtiyaar. 15 Mindhaa wuxuu
cabbaar kaaga maqnaa inaad weligaa haysatid; **(aiōnios
g166)** 16 laakiinse aadan mar dambe u haysan addoon
sidiis, illowse si mid addoon ka wanaagsan oo ah walaal
aan khusuusan anigu jeclahay, laakiinse adigu aad iga sii
jeceshahay, xagga jidhka iyo xagga Rabbigaba. 17 Haddaba
haddaad igu tirinaysid inaan ahay saaxiibkaaga wax kula
wadaaga, isaga u aqbal sidaad ii aqbali lahayd. 18 Oo
hadduu ku xumeeyey ama wax kaa qabo, aniga igu xisaab.
19 Anigoo Bawlos ah waxaan gacantayda ku qorayaa, Anigaa
bixin doona. Kugu odhan maayo, Wax baan kugu leeyahay
xataa naftaadaba ha noqotee. 20 Haah, walaalkayow, xagga
Rabbiga farxad aan kaa helo, qalbigaygana xagga Masiixa
ku qabowji. 21 Waxaan aaminsanahay addeeciddaada, oo
sidaas daraaddeed ayaan warqaddan kuugu soo qorayaa,
anigoo garanaya inaad samaynaysid wax ka sii badan
waxaan leeyahay. 22 Isla markaasna ii diyaari meel aan ku
hoydo; waayo, waxaan rajaynayaa in baryadiinna laygu kiin
siiyo. 23 Waxaa ku soo salaamaya Ebafras oo xagga Ciise
Masiix maxbuus ila ah, 24 iyo Markos, iyo Aristarkhos, iyo
Deemaas, iyo Luukos, kuwaas oo ila shaqeeya. 25 Nimcada
Rabbigeenna Ciise Masiix ruuxiinna ha la jirto. Aamiin.

# Cibraaniyada

1 Ilaah wuxuu waagii hore siyaalo badan oo kala
duduwan awowayaasheen kula hadlay nebiyadii, 2
laakiin maalmahan ugu dambaystooda wuxuu inagula
hadlay Wiilkiisa uu ka dhigay kan wax walba dhaxla, kan
uu duniyooyinkana ku sameeyey. **(aiōn g165)** 3 Oo isagu
waa dhalaalka ammaantiisa iyo u-ekaanta ahaantiisa, oo
wax walba wuxuu ku hayaa erayga xooggiisa, oo goortuu
daahirinta dadka dembiyadooda sameeyey dabadeed ayuu
wuxuu fadhiistay Weynaha xagga sare midigtiisa, 4 isagoo
aad uga wanaagsan malaa'igaha siduu u dhaxlay magac ka
sii wanaagsan kooda. 5 Malaa'igihii tee buu marnaba ku yidhi,
Adigu waxaad tahay Wiilkayga, Maantaan ku dhalay? Oo
weliba, Waxaan isaga u noqon doonaa Aabbe, Oo isaguna
wuxuu ii noqon doonaa Wiil? 6 Oo weliba, markuu curadka
dunida dhex keenayay, wuxuu yidhi, Malaa'igaha Ilaah oo
dhammu isaga ha caabudeen. 7 Oo xagga malaa'igahana
wuxuu ka yidhi, Wuxuu malaa'igihiisa ka dhigaa dabaylo,
Kuwa u adeegana dab ololkiis. 8 Laakiin Wiilka wuxuu ka
yidhi, Carshigaagu, Ilaahow, waa weligiis iyo weligiis; Oo
usha qummanaantuna waa usha boqortooyadaada. **(aiōn
g165)** 9 Adigu xaqnimada waad jeclayd, dembigana waad
necbayd, Sidaas daraaddeed Ilaaha Ilaahaaga ahi wuxuu
kuugu subkay Saliidda farxadda, oo kuwa ku weheliyana wuu
kaa sarraysiiyey. 10 Oo, Adigu Rabbiyow, bilowgii dhulkaad
aasaastay, Samooyinkuna waa shuqullada gacmahaaga, 11
Iyagu way baabbi'i doonaan, adiguse waad sii jiraysaa; Oo
kulligood sida dhar bay u duugoobi doonaan, 12 Oo sida
go' baad u laallaabi doontaa, Sida dhar bayna u beddelmi
doonaan; Adiguse sidaadii uun baad tahay Sannadahaaguna
ma dhammaan doonaan. 13 Malaa'igihii tee buu marnaba
ku yidhi, Midigtayda fadhiiso Ilaa aan cadaawayaashaada
cagahaaga hoostooda geliyo? 14 Miyaanay kulligood ahayn
ruuxyo kaalmeeya oo loo soo diray inay shuqul u qabtaan
kuwa badbaadada dhaxli doona?

2 Taa aawadeed waa inaynu aad u dhegaysanno waxaynu
maqalnay waaba intaasoo ay inaga fakadaan. 2 Waayo,
haddii hadalkii malaa'iguhu ku hadleen xaqiiq ahaa, oo
kii kasta oo xadgudub iyo caasinimo sameeyey uu helay
abaalgud xaq ah, 3 sidee baynu u baxsan doonnaa haddaynu
dayacno badbaadintan weyn oo Rabbigu kolkii hore ku
hadlay oo kuwii maqlayna inoo xaqiiqeeyeen? 4 Ilaahna
wuxuu ugu marag furay calaamooyin iyo yaababba, iyo
xoogag kala duduwan, iyo hadiyado Ruuxa Quduuska ahu u
qaybiyey siduu doonayay. 5 Waayo, dunida iman doonta
oo aynu ka hadalno malaa'igaha kama uu hoosaysiin. 6
Laakiin mid baa meel ka marag furay isagoo leh, Bal waa
maxay dadku oo aad u xusuusataa isaga? Ama wiilka
aadanaha, oo aad u soo booqataa? 7 Waxaad isaga wax yar
ka hoosaysiisay malaa'igaha. Waxaanad taaj uga dhigtay
ammaan iyo murwad, Oo waxaad ka sarraysiisay shuqullada
gacmahaaga, 8 Wax walbana cagihiisaad ka hoosaysiisay.
Isagoo wax walba isaga ka hoosaysiiyey, wax uu dhaafay
oo aanu isaga ka hoosaysiinini ma jiraan, laakiin imminka
weli ma aragno wax walba oo isaga laga hoosaysiiyey. 9
Laakiin waxaynu aragnaa Ciise, kan wax yar malaa'igaha
laga hoosaysiiyey, isagoo xanuunka dhimashada aawadiis
ammaan iyo murwad taaj loogu geliyey inuu nimcada Ilaah
dhimashada ugu dhadhamiyo qof walba. 10 Waayo, waa u
ekayd kan wax walba u yihiin, oo wax walba ka yimaadeen,
markuu carruur badan ammaan u keeno, inuu bilaabaha
badbaadadooda xanuun ku kaamilo. 11 Waayo, kan quduus
ka dhiga iyo kuwa quduus laga dhigaaba kulli mid keliya
ayay ka yimaadaan; taas aawadeed isagu kalama xishoodo
inuu iyaga ugu yeedho walaalo, 12 isagoo leh, Magacaaga
waxaan u sheegi doonaa walaalahay, Oo ururka dhexdiisa
ayaan kugu ammaani doonaa. 13 Oo haddana, Isagaan
aamini doonaa, oo haddana, Bal eega, aniga iyo carruurta
Ilaah i siiyey. 14 Carruurtu waxay qayb ka heleen jidh iyo
dhiig, taas aawadeed isaguna sidaas oo kale ayuu uga qayb
qaatay, inuu dhimasho ku baabbi'iyo kii xoogga dhimashada
lahaa, oo ah Ibliiska, 15 iyo inuu furo kulli kuwii cimrigoodii
oo dhan addoonnimo ugu hoos jiray cabsida dhimashada.
16 Waayo, runtii, ma uu qaadan suuradda malaa'igaha,
wuxuuse qaatay tan dhashii Ibraahim. 17 Haddaba waxaa
isaga u ekayd inuu wax walba ugu ekaado walaalihiis, inuu
wadaad sare oo naxariis iyo aamin badan leh u noqdo xagga
waxyaalaha Ilaah, si uu cadhotir ugu noqdo dembiyada
dadka. 18 Waayo, isaga qudhiisu wuu xanuunsaday isagoo
la jirrabay, taas aawadeed wuu karaa inuu caawiyo kuwa la
jirrabo.

3 Haddaba walaalaha quduuska ah oo ka qayb gala
yeedhniinta jannadow, u fiirsada Ciise oo ah Rasuulka iyo
Wadaadka sare ee iimaanka aynu qiranno. 2 Aamin buu u
ahaa kan doortay, sidii Muuseba gurigiisii oo dhan aaminka
ugu ahaa. 3 Waayo, waxaa isaga lagu tiriyey inuu istaahilo
ammaan ka badan tii Muuse, sida kan guriga dhisa uga
murwad badan yahay guriga. 4 Waayo, guri walba mid baa
dhisay, laakiin kan wax walba dhisay waa Ilaah. 5 Oo runtii
Muuse gurigiisa oo dhan aamin buu ugu ahaa sida midiidin,
inuu markhaati u ahaado waxyaalaha mar dambe lagu hadli

doono. 6 Laakiin Masiix aamin buu u ahaa sida wiil gurigiisa
ka sarreeya; oo gurigiisu waa innaga haddaynu ilaa ugu
dambaysta dhiirranaanteenna iyo faanka rajadeenna aad
u xajinno. 7 Haddaba waa sidan waxa Ruuxa Quduuska
ahi leeyahay, Maanta haddaad codkiisa maqashaan, 8
Qalbiyadiinna ha adkaynina sidii wakhtigii dhirifka, Sidii
maalintii jirrabaadda ee cidlada dhexdeeda, 9 Meeshii ay
awowayaashiin igu jirrabeen, oo ay igu tijaabiyeen, Oo ay
afartanka sannadood shuqulladaydii ku arkeen. 10 Taas
daraaddeed qarnigan waan u cadhaysnaa, Oo waxaan idhi,
Had iyo goorba qalbigooday ka qaldamaan, Oo iyagu ma ay
aqoon jidadkaygii. 11 Sidaas daraaddeed anigoo cadhaysan
ayaan waxaan ku dhaartay, Iyagu nasashadayda ma geli
doonaan. 12 Iska jira, walaalayaalow. Yaanu qalbi shar leh
oo aan rumaysad lahayni midkiinna ku jirin, idinkoo Ilaaha
nool ka dheeraanaya. 13 Laakiin maalin kasta iswaaniya,
intii la odhanayo, Maanta, inuusan midkiinna ku engegin
khiyaanada dembiga. 14 Waayo, waxaynu noqonnay kuwa
Masiix ka qayb qaatay, haddaynu aad u xajinno bilowgii
kalsoonaanteenna ilaa ugu dambaysta, 15 inta la leeyahay,
Maanta haddaad codkiisa maqashaan, Qalbiyadiinna ha
adkaynina sidii wakhtigii dhirifka. 16 Waayo, yaa, markay
maqleen, Ilaah ka dhirfiyey? Miyaanay ahayn kulligood kuwii
Muuse ka keenay Masar? 17 Oo yuu afartan sannadood
u cadhaysnaa? Miyaanay ahayn kuwii dembaabay oo
meydadkoodu cidlada ku dhacdhaceen? 18 Oo yuu ku
dhaartay inaanay nasashadiisa gelin, kuwii isaga addeeci
waayay mooyaane? 19 Oo waxaynu aragnaa inaanay geli
karin rumaysaddarro aawadeed.

**4** Sidaas daraaddeed aynu cabsanno, inta ballan
nasashadiisa lagu gelayaa jiro, inaan midkiinna u ekaan
mid gaadhi waayay. 2 Waayo, innagana war wanaagsan
baa laynagu wacdiyey sidooda oo kale, laakiin hadalkay
maqleen waxba uma uu tarin iyaga, maxaa yeelay, kuwii
maqlay rumaysad kuma ay darin. 3 Waayo, kuweenna
rumaystay, nasashadaas waynu galnaa, siduu u yidhi,
Sidaas daraaddeed anigoo cadhaysan ayaan waxaan ku
dhaartay, Iyagu nasashadayda ma geli doonaan, in kastoo
ay shuqulladii ka dhammaadeen aasaaska dunida. 4 Waayo,
isagu meel buu maalintii toddobaad sidan ka yidhi, Maalintii
toddobaad Ilaah baa shuqulladiisii oo dhan ka nastay. 5
Meeshatanna mar kale wuxuu yidhi, Iyagu nasashadayda
ma geli doonaan. 6 Haddaba waxaa hadhay qaar gelaya, oo
kuwii kolkii hore warkii wanaagsanaa lagu wacdiyey way geli
waayeen caasinimo aawadeed. 7 Taas daraaddeed haddana
mar kale maalintoo buu gooni u dhigay, isagoo wakhti dheer
dabadeed qorniinka Daa'uud ku leh, Maanta, sidii kolkii hore
la yidhi, Maanta haddaad codkiisa maqashaan, Qalbiyadiinna
ha adkaynina. 8 Waayo, haddii Yashuuca iyagii nasiyey,
Ilaah markaas dabadeed kama uu hadleen maalin kale. 9
Sidaas daraaddeed waxaa dadka Ilaah u hadha nasasho.
10 Waayo, kii nasashadiisa galay, isaga qudhiisuna waa
ka nastay shuqulladiisii sidii Ilaah kuwiisii uga nastay. 11
Haddaba aynu u dadaalno inaynu nasashadaas galno inaan
ninna caasinimadaas oo kale ku dhicin. 12 Waayo, hadalka
Ilaah wuu nool yahay, waana shaqeeyaa, oo waa ka af badan
yahay seef kasta oo laba af leh, isagoo ka dhex dusaya ilaa
kala soocniinta nafta iyo ruuxa, iyo xubnaha iyo dhuuxaba,
waana kala gartaa fikirrada iyo waxyaalaha qalbiga ku jira.
13 Oo uun aan hortiisa ka muuqani ma jiro, laakiin wax waliba
way qaawan yihiin oo bannaan yihiin indhihiisa hortooda,
kan aynu ku tirsan nahay. 14 Haddaba innagoo leh wadaad
sare oo weyn, kan samooyinka sii dhex maray, kaas oo
ah Ciisoo Wiilka Ilaah ah, aynu qirashadeenna xajinno. 15
Waayo, ma aynu lihin wadaad sare oo aan itaaldarradeenna
ka nixi karin, laakiin waxaynu leennahay mid si walba loo
jirrabay sideenna oo kale, oo aan weliba dembi lahayn.
16 Haddaba aynu carshiga nimcada dhiirranaan ugu soo
dhowaanno si aynu naxariis u qaadanno oo aynu u helno
nimco ina caawisa wakhtiga baahida.

**5** Wadaad sare oo kasta, oo dadka laga dhex bixiyo, waxaa
dadka loogu doortaa waxyaalaha Ilaah ku saabsan, inuu
hadiyado iyo allabaryoba u bixiyo dembiyada aawadood. 2
Isagu waa u naxariisan karaa kuwaan aqoonta lahayn iyo
kuwa qaldan, maxaa yeelay, isaga qudhiisuba wuu itaal
daranyahay. 3 Oo sidaas daraaddeed waa inuu qudhiisa
wax ugu bixiyo dembiyada aawadood, siduu dadka wax ugu
bixiyo oo kale. 4 Ninna murwadda iskama qaato, laakiin waa
kii Ilaah ugu yeedho siduu Haaruun ugu yeedhay. 5 Sidaas
oo kale Masiixu isma ammaanin inuu noqdo wadaad sare,
laakiin waxaa doortay kan ku yidhi, Adigu waxaad tahay
Wiilkayga, Maantaan ku dhalay. 6 Meel kalena wuxuu ka
yidhi. Adigu weligaaba wadaad baad tahay Sidii derejadii
Malkisadaq. **(aiōn g165)** 7 Masiixu maalmihii jidhkiisa wuxuu
tukasho iyo baryooyin qaylo dheer iyo ilmo ugu bixiyey
kan kara inuu isaga dhimasho ka badbaadiyo, waana loo
maqlay cibaadadiisa. 8 In kastuu wiil ahaa, weliba wuxuu
addeecid ku bartay waxyaalihii uu ku xanuunsaday; 9 oo
goortuu kaamil noqday wuxuu kuwa isaga addeeca oo
dhan u noqday sababta badbaadada weligeed ah. **(aiōnios
g166)** 10 Oo Ilaah baa isaga wuxuu ku magacaabay wadaad
sare sidii derejadii Malkisadaq. 11 Waxaannu haysanna

waxyaalo badan oo aannu kan kaga hadalno, laakiin waa fasir adag yahay dhegaculayskiinna aawadiis. 12 Wakhtigii aad macallimiin noqon lahaydeen ayaad haddana u baahan tihiin in laydin baro waxyaalaha ugu horreeya ee Ereyada Ilaah, oo waxaad noqoteen sidii kuwa caano u baahan ee aan cunto adag u baahnayn. 13 Waayo, mid kasta oo ay cuntadiisu caano tahay aqoon uma laha hadalka xaqnimada, waayo, waa ilmo yar. 14 Laakiin cuntada adag waxaa leh dadka waaweyn oo ah kuwa ku isticmaalidda kaskooda ku kala garta wanaagga iyo xumaanta.

6 Taas daraaddeed aynu iska dayno ka hadlidda waxyaalihii ugu horreeyey ee Masiix, oo hore aynu ugu soconno kaamilnimada, oo yeynan mar kale dhigin aasaaska ka-toobadkeenidda shuqulladii dhintay, iyo iimaanka xagga Ilaah, 2 iyo waxbaridda baabtiisyada, iyo gacmo-dul-saaridda, iyo sarakicidda kuwii dhintay, iyo xukunka weligiis ah. (aiōnios g166) 3 Oo tan waynu samayn doonnaa haddii Ilaah idmo. 4 Kuwii mar loo iftiimiyey, oo hadiyaddii jannada dhadhamiyey, oo laga dhigay kuwa ka qayb galay Ruuxa Quduuskaa, 5 oo dhadhamiyey eraygii wanaagsanaa ee Ilaah iyo xoogagga wakhtiga iman doona, (aiōn g165) 6 oo dabadeedna dhacay, ma suurtowdo in loo cusboonaysiiyo toobadkeenidda, iyagoo mar kale Wiilka Ilaah iskutallaabta isugu qodbaya oo bayaan u ceebaynaya. 7 Waayo, dhulka cabbay roobka marar badan ku dul da'a, oo u soo saara geedo u wanaagsan kuwii beeray, wuxuu Ilaah ka helaa barako, 8 laakiin hadduu dhalo qodxan iyo yamaarug, waxtar ma leh, oo habaar buu ku dhow yahay, ugudambaystiisana waa in la gubaa. 9 Laakiin gacaliyayaalow, wax ka wanaagsan oo idinku saabsan ayaa lana aaminsiiyey iyo waxyaalaha badbaadada, in kastoo aannu sidan u hadalnay. 10 Waayo, Ilaah ma xaqdarra, mana illoobo shuqulkiinna iyo jacaylka aad magiciisa u qabtaan, maxaa yeelay, quduusiinta ayaad u adeegteen oo weli waad u adeegtaan. 11 Oo annagu waxaannu jecel nahay in midkiin kastaa muujiyo dadaalkaas oo kale tan iyo hubaasha rajada ilaa ugu dambaysta, 12 inaydnaan caajisiin noqon laakiin aad noqotaan kuwo ku dayda kuwa rumaysadka iyo dulqaadashada ku dhaxla ballamada. 13 Markii Ilaah ballan u qaaday Ibraahim, isagoo mid ka weyn oo uu ku dhaarto aan haysan, ayuu isku dhaartay, 14 isagoo leh, Hubaal waan ku barakayn doonaa, oo waan ku kordhin doonaa. 15 Oo sidaas isagoo u dulqaadanaya ayuu helay wixii loo ballanqaaday. 16 Waayo, dadku waxay ku dhaartaan kan iyaga ka weyn, oo waxaa muran kasta oo kooda ah ugu dambaysa dhaar si loo xaqiiqaysto, 17 sidaas daraaddeed, Ilaah, isagoo aad u doonaya inuu kuwa ballanka dhaxla tuso taladiisa aan beddelmi karin, ayuu dhaar ku galay; 18 in laba waxyaalood, oo aan beddelmi karin, oo aan suurtoobin inuu Ilaah been ka sheego, aynu ku helno dhiirranaan xoog leh innagoo magangal u soo cararnay si aynu u qabsanno rajada ina hor taal, 19 tan aynu sida barroosinka nafta u haysanno, mid adkaan iyo hubaalba ah oo gelaysa waxa daaha ka shisheeya, 20 meeshii Ciise sida horseed inoo galay isagoo noqday wadaad sare oo weligiis ah sidii derejadii Malkisadaq. (aiōn g165)

7 Malkisadaqan, oo Saalem boqorka u ahaa, wadaadkii Ilaaha ugu sarreeyana ahaa, wuxuu la kulmay Ibraahim oo ka soo noqday layntii boqorrada, wuuna barakeeyey. 2 Oo Ibraahim wuxuu isagii wax kasta ka siiyey toban meelood oo meel. Malkisadaq hortii waxaa magiciisii lagu fasiray, Boqorka Xaqnimada, dabadeedna, Boqorka Saalem, oo ah Boqorka Nabadda. 3 Aabbe ma lahayn, hooyona ma lahayn, abtirsiinyona ma lahayn, oo isagoo aan lahayn bilowga maalmaha ama dhammaadka nolosha laakiin loo ekaysiiyey Wiilka Ilaah, ayuu weligiis wadaad sii ahaanayaa. 4 Haddaba ka fiirsada ninkanu siduu u weynaa, kan Ibraahim oo madaxda awowayaashii ahi meeltobnaad ka siiyey boolidii. 5 Oo runtii kuwii qoladii Laawi oo helay shuqulka wadaadnimada waxay haystaan amar ay dadka kaga qaataan meeltobnaadka sida sharcigu leeyahay, kuwaas waxaa weeye walaalahood in kastoo ay kuwanu ka yimaadeen xanjaadka Ibraahim. 6 Laakiin kii aan iyaga ku abtirsanin ayaa wuxuu Ibraahim ka qaatay meeltobnaadyo, oo barakeeyey kii ballamada loo qaaday. 7 Laakiin muranla'aan kan yar waxaa barakeeya kan ka wanaagsan. 8 Oo halkan waxaa meeltobnaadyada qaata dadka dhinta, laakiin halkaas mid loo markhaati furay inuu nool yahay. 9 Waxaa la odhan kara, Laawiga meeltobnaadyada qaataana, Ibraahim meeltobnaadyo ayuu ku bixiyey. 10 Waayo, isagu weli xanjaadkii aabbihiis buu ku jiray kolkii Malkisadaq la kulmay. 11 Haddaba haddii kaamilnimo ku jirtay wadaadnimadii Laawi, waayo, iyada ayuu dadku sharciga ka hoos helaye, maxaa weli loogu baahnaa in wadaad kale ka kaco derejadii Malkisadaq oo aan lagu magacaabin derejadii Haaruun? 12 Waayo, wadaadnimada markii la beddelo waa lagamamaarmaan in sharcigana la beddelo. 13 Waayo, kii waxyaalahan laga sheegay waa qolo kale oo aan nin meeshii allabariga ka shaqeeyey ka iman. 14 Waa cad dahay in Sayidkeennu ka soo baxay Yahuudah, oo ah qolo aan Muuse kaga hadlin wax wadaaddo ku saabsan. 15 Oo weliba aad bay u sii cad dahay, haddii wadaad kale oo Malkisadaq u egi kaco, 16 kii aan wadaad lagaga dhigin sharciga abtirsiinyada xagga jidhka, laakiin xagga xoogga nolosha aan dhammaadka lahayn. 17

Waayo, isaga waxaa loogu markhaati furay, Adigu weligaaba
wadaad baad tahay Sidii derejadii Malkisadaq. **(aiōn g165)** **18**
Waayo, amarkii hore waxaa loo buriyey itaaldarradiisii iyo
faa'iidola'aantiisii, **19** maxaa yeelay, sharcigu waxba ma uu
kaamilin. Oo waxaa la keenay rajo ka wanaagsan oo aynu
Ilaah ugu dhowaanno. **20** Oo isagu dhaarla'aan wadaad kuma
uu noqon. **21** Iyagu dhaarla'aan bay wadaaddo ku noqdeen,
laakiin isagu wuxuu ku noqday dhaarta kan ku yidhi, Rabbigu
waa dhaartay, kana soo noqon maayo, Adigu weligaaba
wadaad baad tahay. **(aiōn g165)** **22** Oo sidaasuu Ciise ku
noqday dammiinka axdiga ka wanaagsan. **23** Iyaguna waxay
noqdeen wadaaddo tiro badan, maxaa yeelay, dhimashada
ayaa ka joojisay inay sii jiraan: **24** Isaguse wuxuu haystaa
wadaadnimadiisa aan beddelmi karin, waayo, weligiis buu
sii jirayaa. **(aiōn g165)** **25** Sidaas daraaddeed dhammaan
buu u badbaadin karaa kuwa Ilaah ugu dhowaada isaga,
maxaa yeelay, isagu weligiis waa nool yahay si uu ugu
duceeyo iyaga. **26** Waayo, wadaad sare oo caynkan ahu
waa inagu habboonaa, mid quduus ah oo aan khiyaano iyo
wasakh toona lahayn, oo dembilayaasha ka soocan, oo
samooyinka laga sarraysiiyey, **27** kan aan u baahnayn inuu
maalin walba allabari u bixiyo sida wadaaddadii sare, kolka
hore dembiyadiisa aawadood, dabadeedna kuwa dadka
aawadood; tan mar keliya ayuu sameeyey markuu isbixiyey.
**28** Waayo, sharcigu niman itaaldaran ayuu wadaaddo sare ka
dhigaa, laakiin hadalka dhaarta oo sharciga ka dambeeyey
wuxuu ka dhigaa Wiil weligiis kaamil ah. **(aiōn g165)**

**8** Waxyaalihii la yidhi wixii ugu muhimsanaa waa kan,
Waxaynu leennahay wadaad sare oo caynkaas ah,
kan fadhiistay midigta carshiga Weynaha jannooyinka
ku jira, **2** kan u adeega waxyaalaha quduuska ah iyo
taambuugga runta ah ee Rabbigu dhisay oo aan dad dhisin.
**3** Waayo, wadaad kasta oo sare waxaa loo doortay inuu
hadiyado iyo allabaryo bixiyo, sidaas daraaddeed waa
lagamamaarmaan in wadaadkan sarena haysto wax uu
bixiyo. **4** Haddaba hadduu dhulka joogi lahaa, wadaad ma
uu ahaadeen, maxaa yeelay, waxaa jira kuwa hadiyado
u bixiya sida sharcigu leeyahay; **5** kuwa u adeega waxa
ah u-ekaanta iyo hooska waxyaalaha jannada, sidii Muuse
loogu digay kolkuu ku dhowaa inuu taambuugga sameeyo.
Waayo, wuxuu yidhi, Aad ugu fiirso inaad wax walba u
samayso siduu ahaa u-ekaanshihii buurta lagugu tusay. **6**
Laakiin haatan wuxuu helay shuqul aad uga wanaagsan
siduu u yahay dhexdhexaadiyaha axdiga ka wanaagsan
ee lagu dhisay ballamo ka wanaagsan. **7** Waayo, haddii
axdigii hore uusan eed lahayn, mid labaad meella looma
dooneen. **8** Wuxuu yidhi, isagoo iyaga eedaynaya, Bal eega,
maalmihii waa imanayaan, ayaa Rabbigu leeyahay, Oo anigu
axdi cusub baan la dhigan doonaa reer Israa'iil iyo reer
Yahuudah; **9** Oo aan ahayn axdigii aan awowayaashood
la dhigtay oo kale Maalintii aan iyaga gacanta qabtay
inaan ka kaxeeyo dalka Masar, Waayo, iyagu kuma ay
sii socon axdigaygii, Aniguna farahaan ka qaaday, ayaa
Rabbigu leeyahay. **10** Waayo, kanu waa axdiga aan la
dhigan doono reer Israa'iil Maalmahaas dabadood, ayaa
Rabbigu leeyahay; Qaynuunnadayda waxaan gelin doonaa
maankooda, Qalbigoodana waan ku qori doonaa, Oo Ilaah
baan u ahaan doonaa, Iyaguna dad bay ii ahaan doonaan;
**11** Oo iyagu ma bari doonaan mid walba deriskiisa Iyo mid
walba walaalkiis, iyagoo leh, Rabbiga garo, Waayo, kulli
way i garan doonaan, Kan ugu yar ilaa kan ugu weyn.
**12** Waayo, iyagoo xaqdaran baan u naxariisan doonaa,
Dembiyadoodana kol dambe ma xusuusan doono. **13** Kolkuu
yidhi, Axdi cusub, ayuu kii hore duug ka dhigay. Laakiin kan
duugoobayaa oo gaboobayaa wuxuu u dhow yahay inuu
libdho.

**9** Xataa axdigii hore wuxuu lahaa qaynuunno ku saabsan
caabudid, iyo meel quduus ah ee dunidatan. **2** Waayo,
waxaa la dhisay taambuug; intii hore waxaa ku jiray
laambadaha isku yiil, iyo miiska, iyo kibista tusniinta, oo
waxaa la odhan jiray Meeshii Quduuska ahayd. **3** Daaha
labaad shishediisa waxaa ku jiray taambuuggii la odhan
jiray, Quduuskii Quduusyada, **4** isagoo leh girgire dahab ah
oo foox lagu shido, iyo sanduuqii axdiga oo kulligiis dahab
lagu dahaadhay, dhexdiisana waxaa ku jiray weel dahab
ah oo maannadii ku jirto, iyo ushii Haaruun oo magooshay,
iyo looxyadii axdiga; **5** dushiisana Keruubiimtii ammaanta
oo hadhaynaya daboolka kafaaraggudka, waxyaalahaas
oo aannan hadda gooni gooni uga hadli karin. **6** Haddaba
waxyaalahan oo sidaas loo diyaariyey, wadaaddadu waxay
had iyo goor galaan taambuugga kowaad iyagoo shuqulka
dhammaynaya. **7** Laakiin kan labaad waxaa sannaddiiba
mar gala wadaadka sare oo keliya, isagoo aan dhiigla'aan
gelaynin. Oo dhiiggaas wuxuu u bixiyaa naftiisa iyo dembiyada
dadku aqoonla'aanta ku sameeyo. **8** Ruuxa Quduuska ahu
wuxuu tilmaamaa inaan jidkii Quduuskii Quduusyada weli la
muujin, inta taambuugga hore weli taagan yahay. **9** Tani
wakhtiga la joogo waa masaal, sida loo bixiyo hadiyado iyo
allabaryo, kuwaas oo aan kaamil ka dhigi karin caabudaha
niyadiisa, **10** iyagoo ku saabsan cuntooyin iyo cabbitin iyo
maydhmaydhid kala duwan oo ah amarrada jidhka oo keliya
oo la dejiyey ilaa wakhtiga hagaajinta. **11** Masiixu wuxuu

yimid, isagoo ah wadaadka sare ee waxyaalaha wanaagsan
oo iman doona. Taambuuggii wadaadnimadiisu wuxuu ahaa
ku ka weyn oo ka kaamilsan, oo aan gacmo lagu samayn,
kaasu waxaa weeyaan mid aan abuuristan ka iman. 12 Mar
buu wada galay meeshii quduuska ahayd, isagoo aan orgiyo
iyo weylal dhiiggoodii wadin, laakiin wuxuu waday dhiiggiisa,
sidaasuu furasho weligeed ah inoogu helay. **(aiōnios g166)**
13 Waayo, haddii orgiyo iyo dibiyo dhiiggooda, iyo qaalin
dambaskeeda lagu rusheeyo kuwa nijaasoobay, ay quduus
ka dhigaan in jidhka la nadiifiyo, 14 intee ka badan ayuu
dhiigga Masiix, kan Ruuxa weligiis ah isugu bixiyey Ilaah
isagoo aan eed lahayn, niyadiinna ka nadiifin kara shuqullada
dhintay si aad ugu adeegtaan Ilaaha nool? **(aiōnios g166)** 15
Oo sidaas daraaddeed isagu waa dhexdhexaadiyaha axdiga
cusub in kuwii loo yeedhay ay helaan dhaxalka weligiis ah
oo la ballanqaaday, waayo, dhimashadu waxay u noqotay
ka madaxfurashada xadgudubyada lagu sameeyey axdigii
hore. **(aiōnios g166)** 16 Waayo, meeshii dardaaran jiro waa
lagamamaarmaan inuu kii dardaarmay dhinto. 17 Waayo,
dardaaranka waa la fuliyaa meeshii dhimasho jirto, maxaa
yeelay, waxba ma taro intii kii dardaarmay nool yahay.
18 Haddaba xataa axdigii hore laguma gelin dhiigla'aan.
19 Waayo, markii Muuse amar kasta kula hadlay dadka
oo dhan sida sharcigu leeyahay, wuxuu qaaday dhiiggii
weylalka iyo orgiyada, iyo biyo, iyo dhogor guduudan, iyo
geed husob la yidhaahdo, oo wuxuu ku rusheeyey kitaabka
qudhiisa iyo dadka oo dhanba, 20 isagoo leh, Kanu waa
dhiiggii axdiga oo Ilaah idinku amray. 21 Sidaas oo kalena
taambuugga iyo weelasha lagu adeego oo dhan ayuu ku
rusheeyey dhiiggii. 22 Inta badan wax walba waxaa lagu
nadiifiyaa dhiig sida sharcigu leeyahay, oo dhiigdaadinla'aan
dembidhaaf ma jiro. 23 Haddaba lagamamaarmaan bay
ahayd in u-ekaanta waxyaalaha jannooyinka ku jira kuwan
lagu nadiifiyo; laakiin waxyaalaha jannada qudhooda waa in
lagu nadiifiyo allabaryo kuwan ka wanaagsan. 24 Masiixu
ma uu gelin meel quduus ah oo gacmo lagu sameeyey, oo u
eg tan runta ah, laakiin wuxuu galay jannada qudheeda inuu
hadda Ilaah hortiisa inooga muuqdo. 25 Weliba uma uu gelin
inuu marar badan isbixiyo, sida wadaadka sare meesha
quduuska ah sannad walba ula galo dhiig uusan lahayn. 26
Haddii kale lagamamaarmaan bay ahayd inuu marar badan
xanuunsado tan iyo aasaaskii dunida; laakiin haatan oo
dhammaadkii wakhtiga ah isaga mar keliya ayaa la muujiyey
inuu dembiga ku baabbi'iyo allabarigiisa. **(aiōn g165)** 27 Waxaa
dadka looga dhigay inay mar dhintaan, taas dabadeedna la
xukumo, 28 sidaas oo kalena Masiix, isagoo mar loo bixiyey
inuu qaado dembiyada kuwa badan, ayuu dembila'aan mar
labaad badbaadin ugu muuqan doonaa kuwa isaga sugaya.

**10** Waayo, sharcigu wuxuu leeyahay hooska waxyaalaha
wanaagsan oo iman doona, laakiin ma leh suuradda
waxyaalahaas qudheeda. Oo caabudayaasha marnaba
kaamil kagama uu dhigi karo allabaryo sannad walba
had iyo goor la bixiyo. 2 Haddii kale miyaan la joojiyeen
in allabaryo la bixiyo? Maxaa yeelay, caabudayaashu,
iyagoo mar la nadiifiyey, mar dambe dembiyo iskama ay
garteen. 3 Laakiin allabaryadaas waxaa sannad walba
lagu xusuustaa dembiyo. 4 Waayo, ma suurtowdo in
dibiyo iyo orgiyo dhiiggoodu dembiyo qaado. 5 Saas
daraaddeed kolkuu Masiixu dunida soo galay wuxuu lahaa,
Allabaryo iyo qurbaan ma aad doonaynin, Laakiin jidh baad
ii diyaarisay. 6 Waxyaalo la bixiyo oo la gubo oo dhan iyo
dembi allabaryadiis kuma aad faraxsanayn. 7 Markaasaan
idhi, Bal eeg, waxaan u imid Inaan sameeyo doonistaada,
Ilaahow. Kitaabka duudduuban wax igu saabsan baa ku
qoran. 8 Siduu horay u yidhi, Allabaryo iyo qurbaan iyo
waxyaalo la bixiyo oo la gubo iyo dembi allabaryadiis ma
aad doonayn, kumana aad faraxsanayn, kuwaas oo loo
bixiyo sida sharcigu leeyahay. 9 Markaasuu yidhi, Bal eeg,
waxaan u imid inaan sameeyo doonistaada. Wuxuu rujiyey
kii kowaad si uu ka labaad u taago. 10 Sida doonistaasu
tahay, waxaa quduus laynagaga dhigay bixinta jidhka Ciise
Masiix oo mar keliya la bixiyey. 11 Wadaad waluba maalin
kastuu istaagaa isagoo adeegaya oo marar badan bixinaya
allabaryo isku mid ah, kuwa aan marnaba dembiyo qaadi
karin, 12 laakiin isagu kolkuu allabari keliya mar keliya
dembiyo u bixiyey ayuu fadhiistay midigta Ilaah; 13 isagoo
markaas dabadeed sugaya ilaa cadaawayaashiisa cagihiisa
hoostooda la geliyo. 14 Maxaa yeelay, bixin keliya ayuu
kaamil kaga dhigay weligood kuwa quduus laga dhigay.
15 Oo taas Ruuxa Quduuska ahuna markhaati ahaan
buu noogu sheegaa, waayo, kolkuu yidhi, 16 Kanu waa
axdiga aan la dhigan doono iyaga Maalmahaas dabadood,
ayaa Rabbigu leeyahay; Qaynuunnadayda waxaan gelin
doonaa qalbigooda, Maankoodana waan ku qori doonaa;
markaasuu wuxuu ku daray; 17 Oo dembiyadooda iyo
xadgudubyadoodana mar dambe ma xusuusan doono.
18 Markii waxyaalahan la cafiyo, wax dambe oo dembi
loo bixiyaa ma jiro. 19 Taas daraaddeed, walaalayaalow,
waxaynu haysannaa dhiirranaan inaynu meesha quduuska
ah ku galno dhiigga Ciise, 20 oo ah waddo cusub oo nool oo
uu inooga banneeyey daaha, kaas oo ah jidhkiisa. 21 Oo
waxaynu haysannaa wadaad weyn oo ka sarreeya guriga

Ilaah. 22 Taas daraaddeed aynu ugu soo dhowaanno qalbi
run ah iyo hubaal rumaysad, iyadoo qalbiyadeenna laga
nadiifiyey niyo shar leh, jidhkeennana lagu maydhay biyo
daahir ah. 23 Aynu aad u xajinno qirashada rajadeenna
liicliicashola'aan, maxaa yeelay, kan inoo ballanqaaday waa
aamin. 24 Oo midkeenba midka kale ha ka fikiro si aynu
isugu guubaabinno kalgacayl iyo shuqullo wanaagsan. 25
Yeynan iska daynin isku ururkeenna sida ay tahay caadada
dadka qaarkood, laakiin aan isdhiirrigelinno, khusuusan
markaad aragtaan inay Maalintu soo dhowaanayso. 26
Haddaynu badheedh u dembaabno kolkaynu aqoonta runta
helnay dabadeed, allabari dambe oo dembiyo loo bixiyaa
ma hadho. 27 Laakiin waxaa u hadha filasho cabsi leh
oo xukun, iyo dab kulul oo baabbi'in doona kuwa Ilaah ka
geesta ah. 28 Ninkii diida sharciga Muuse kolkii laba ama
saddex nin ku markhaati furaan ayuu naxariisla'aan dhintaa.
29 Taqsiir intee le'eg oo ka sii xun baad u malaynaysaan
inuu istaahili doono kii Wiilka Ilaah ku joogjoogsaday, oo
dhiigga axdiga oo isaga quduuska lagaga dhigay ku tiriyey
wax aan quduus ahayn, oo caayay Ruuxa nimcada? 30
Waayo, innagu waynu naqaan kan yidhi, Aarsasho anigaa
leh; oo waan abaalmarin doonaa. Mar kalena waxaa la yidhi,
Rabbigu dadkiisa wuu xukumi doonaa. 31 Waa wax aad
cabsi u leh in lagu dhaco gacmaha Ilaaha nool. 32 Laakiin
xusuusta maalmihii hore, kolkii laydin iftiimiyey dabadeed,
oo aad u adkaysateen dagaal weyn oo xanuunno badan
leh. 33 Mar waxaa laydinku bandhigay cay iyo dhibaatooyin,
marna waxaad wax la wadaagteen kuwa sidaas oo kale loo
galay. 34 Waayo, waad u naxariisateen kuwii xidhnaa, farxad
baadna ku aqbasheen dhicitinka maalkiinna la dhacay,
idinkoo og inaad idinka qudhiinnu maal ka wanaagsan oo
raagaya haysataan. 35 Sidaas daraaddeed ha iska tuurina
dhiirranaantiinna abaalgudka weyn leh. 36 Waayo, waxaad
dulqaadasho ugu baahan tihiin si aad u qaadataan wixii
laydiin ballanqaaday markaad doonista Ilaah samaysaan
dabadeed. 37 Wakhti yar dabadeed Kii iman lahaa wuu
iman doonaa, mana raagi doono. 38 Laakiin kayga xaqa
ahu rumaysad buu ku noolaan doonaa; Oo hadduu dib u
noqdo, naftaydu kuma farxi doonto isaga. 39 Innagu ma ihin
kuwa halaagga dib ugu noqda, laakiin waxaynu nahay kuwa
rumaysad leh si naftu u badbaaddo.

**11** Rumaysadku waa hubaasha waxyaalaha la rajeeyo,
iyo xaqiiqaynta waxyaalaha aan la arkin. 2 Waayo,
saasaa loogu markhaati furay waayeelladii. 3 Rumaysad
ayaynu ku garanaynaa in duniyooyinka lagu abuuray erayga
Ilaah, sidaas daraaddeed waxa la arko lagama samayn waxa
muuqda. (aiōn g165) 4 Haabiil rumaysad ayuu Ilaah ugu bixiyey
allabari aad uga wanaagsan kii Qaabiil, sidaas daraaddeed
waxaa loogu markhaati furay inuu xaq yahay, Ilaahna waa
ka markhaati furay hadiyadihiisii. Saas daraaddeed isagoo
dhintay ayuu weli hadlaa. 5 Enoog rumaysad baa kor loogu
qaaday si uusan dhimasho u arag, lamana helin, maxaa
yeelay, Ilaah baa isagii qaaday, waayo, intaan kor loo qaadin
ka hor ayaa markhaati loo furay inuu Ilaah ka farxiyey. 6 Oo
rumaysadla'aantiis ma suurtowdo in isaga laga farxiyo, taas
aawadeed kan Ilaah u yimaadaa waa inuu rumaysto inuu jiro
oo uu yahay kan u abaalguda kuwa isaga doondoona. 7
Nuux oo Ilaah uga digay waxyaalo aan weli la arkin ayaa
cabsaday, oo rumaysad buu ku diyaariyey doonni in reerkiisu
ku badbaado, sidaasuu dunida u xukumay oo ku noqday mid
dhaxla xaqnimada rumaysadka ku timaada. 8 Ibraahim kolkii
loo yeedhay, rumaysad buu ku addeecay inuu tago meeshuu
ku heli lahaa dhaxalka, wuuna tegey isagoo aan garanaynin
meeshuu ku socdo. 9 Rumaysad buu ku degganaa dhulkii
loo ballanqaaday sidii dhul qalaad, wuxuuna taambuugyo
la degganaa Isxaaq iyo Yacquub oo ahaa kuwii la dhaxlay
isku ballan. 10 Waayo, wuxuu filanayay magaalo aasaas
leh oo kan dhisay oo sameeyey uu Ilaah yahay. 11 Saarah
qudheedu rumaysad bay ku heshay xoog ay ku uuraysato,
oo iyadoo dhaaftay wakhtigii dhalmada ayay dhashay,
waayo, waxay ku tirisay ku aamin ah kii u ballanqaaday. 12
Sidaas daraaddeedna waxaa mid sidii nin dhintay oo kale
ah ka dhashay dad u badan sida xiddigaha cirka iyo sida
cammuudda badda xeebteeda taal oo aan la tirin karin. 13
Kuwaasu kulligood rumaysad bay ku wada dhinteen, iyagoo
aan helin waxyaalihii loo ballanqaaday, laakiin meel fog
bay ka arkeen oo way aqbaleen, oo waxay qirteen inay
dhulka ku ahaayeen shisheeyayaal iyo dad sodcaal ah.
14 Waayo, kuwa waxyaalahan oo kale yidhaahdaa waxay
muujiyaan inay doondoonayaan waddan kooda ah. 15 Oo
hadday xusuusnaayeen waddankii ay ka baxeen way heli
lahaayeen wakhti ay ku noqdaan. 16 Laakiin imminka waxay
aad u doonayaan waddan ka wanaagsan oo ah jannada,
sidaas daraaddeed Ilaah ka xishoon maayo in loogu yeedho
Ilaahood, waayo, wuxuu iyaga u diyaariyey magaalo. 17
Ibraahim kolkii la jirrabay, rumaysad buu Isxaaq allabari
ahaan ugu bixiyey. Kii ballamada aqbalay ayaa wuxuu
bixinayay wiilkiisii keliyaha, 18 in kastoo lagu yidhi, Kuwa
Isxaaq ka farcama ayaa farcankaaga loogu yeedhi doonaa.
19 Wuxuu ku tirinayay in Ilaah ka kicin karo xataa kuwii
dhintay; oo sida masaal oo kale ayuu isagii uga helay kuwii
dhintay. 20 Isxaaq rumaysad buu ugu duceeyey Yacquub
iyo Ceesaw xagga waxyaalaha iman doona. 21 Yacquubna

markuu dhimanayay rumaysad buu ugu duceeyey mid kasta
oo wiilashii Yuusuf ka mid ah, oo Ilaahna wuu caabuday
isagoo cuskanaya ushiisa guudkeeda. 22 Yuusufna markii
dhimashadiisii dhowayd rumaysad buu kaga hadlay bixitinka
reer binu Israa'iil, wuxuuna ka dardaarmay lafihiisa. 23
Muusena markuu dhashay, waalidkiis rumaysad bay ku
qariyeen saddex bilood, maxaa yeelay, waxay arkeen inuu
ilmo wanaagsan yahay, kamana ay cabsan amarkii boqorka.
24 Muuse markuu weynaaday rumaysad buu ku diiday in
loogu yeedho wiilkii gabadha Fircoon. 25 Oo wuxuu ka
doortay in lala silciyo dadkii Ilaah intuu wakhti yar dembi ku
farxi lahaa; 26 isagoo ku tirinaya cayda lagu caayo Masiixa
aawadiis inay ka qiimo weyn tahay maalka Masar, waayo,
wuxuu filanayay abaalgudka. 27 Rumaysad buu kaga tegey
Masar isagoo aan ka cabsanayn boqorka cadhadiisii, waayo,
wuxuu u adkaystay sidii mid fiirinaya kan aan la arkin.
28 Rumaysad buu ku sameeyey Kormaridda iyo dhiigga
rushayntiisii inuusan Baabbi'iyihii curadyadu iyaga taaban.
29 Rumaysad bay ku dhex mareen Badda Cas sidii dhul
engegan, laakiin markay Masriyiintu saas isku dayeen, way
liqday. 30 Derbiyadii Yerixoo rumaysad bay ku dumeen kolkii
toddoba maalmood lagu warwareegay dabadeed. 31 Dhilladii
Raxab rumaysadkeedii aawadiis lama ay halligmin kuwii
caasiyiinta ahaa, maxaa yeelay, basaasyadii bay nabad ku
dhowaysay. 32 Oo maxaan kale oo idhaahdaa? Waayo,
wakhtigu waa igu gaabnaan doonaa haddaan wax ka sheegi
lahaa Gidcoon, iyo Baaraaq, iyo Samsoon, iyo Yeftaah, iyo
Daa'uud, iyo Samuu'eel iyo nebiyadii. 33 Rumaysad bay kaga
adkaadeen boqortooyooyin, oo xaqnimo ku sameeyeen,
oo ballamo ku heleen, oo afafka libaaxyada ku xidheen,
34 oo xooggii dabka ku demiyeen, oo seefta afkeedii kaga
baxsadeen, oo itaaldarradii kaga xoogaysteen, oo dagaal ku
itaal weynaadeen, oo colalkii shisheeyaha ku eryeen. 35
Dumar baa waxay heleen kuwii ka dhintay iyagoo la sara
kiciyey, qaar kalena waa la xanuujiyey ilaa ay ka dhinteen
iyagoo aan aqbalin in la samatabbixiyo si ay ku gaadhaan
sarakicid ka wanaagsan. 36 Qaar kalena waxay jirrabaad
ahaan ula kulmeen majaajilo iyo karbaashid iyo weliba
silsilado iyo xabbis. 37 Waana la dhagxiyey, miinshaarna
waa lagu kala jeexay, waana la jirrabay, seefna waa lagu
gowracay, wayna warwareegeen iyagoo qaba hargo idaad
iyo hargo riyood, iyagoo caydh ah oo la dhibay oo la silciyey.
38 Dunidu ma ay istaahilin iyagii. Waxayna warwareegi
jireen lamadegaanka iyo buuraha iyo boholaha iyo godadka
dhulka. 39 Kuwaas oo dhammu, iyagoo loo markhaati
furay rumaysadkoodii daraaddiis, ayaanay helin wixii loo
ballanqaaday; 40 waayo, Ilaah wuxuu hore u arkay wax ka
wanaagsan oo inagu saabsan, inaan la'aanteen iyaga kaamil
laga dhigin.

**12** Sidaas daraaddeed, innagoo haysanna markhaatiyaal
badan oo sida daruur u weyn oo inagu wareegsan,
aynu iska dhigno culays kasta iyo dembiga dhibyaraanta
inoogu dhegaya, oo aynu adkaysasho ku orodno tartanka
ina hor yaal, 2 innagoo fiirinayna Ciise oo ah Bilaabaha
iyo Dhammeeyaha rumaysadkeenna, kii farxaddii hor tiil
daraaddeed u adkaystay iskutallaabta, isagoo fududaysanaya
ceebta, oo fadhiistay midigta carshiga Ilaah. 3 Haddaba
ka fiirsada kii u adkaystay hadalkii ka geesta ahaa oo
dembilayaasha inaydnaan daalin oo aanay nafihiinnu itaal
beelin. 4 Idinkoo dembi la dagaallamaya weli iskama
aydnaan celin ilaa dhiig idinka daato. 5 Waxaad illowdeen
waanada idiinla hadasha sida wiilal oo kale. Wiilkaygiiyow,
ha fududaysan Rabbiga edbintiisa, Hana itaal beelin kolkuu
ku canaanto. 6 Waayo, ka uu Rabbigu jecel yahay ayuu
edbiyaa, Wuuna karbaashaa wiil kasta oo uu aqbalo. 7
U adkaysta edbinta. Ilaah wuxuu idiinla macaamiloodaa
sida wiilal oo kale; waayo, waa wiilkee kan aanu aabbihii
edbin? 8 Laakiin haddaan laydinku edbin edbinta laga wada
qayb galo, haddaba waxaad tihiin garacyo, oo wiilashiisii
ma ihidin. 9 Oo weliba waxaynu lahayn aabbayaal xagga
jidhka ah, oo ina edbiyey, oo waynu maamuusnay. Miyaynan
intaas in ka badan ka dambaynayn Aabbaha ruuxyada oo
aynaan noolaannayn? 10 Waayo, iyagu dhawr maalmood
ayay inoo edbiyeen sidii la wanaagsanayd, laakiin isagu
wuxuu inoo edbiya si inoo faa'iido ah si aynu uga qayb galno
quduusnimadiisa. 11 Edbinina wakhtiga la joogo uma eka
mid lagu farxo, laakiin waxay u eg tahay mid caloolxumo leh,
laakiin dabadeedto waxay kuwii lagu edbiyey u dhashaa
midho nabad iyo xaqnimo ah. 12 Sidaas daraaddeed
xoogeeya gacmaha taagta daran iyo jilbaha tabarta yar. 13
Cagihiinnana waddooyin toosan u sameeya si aan curyaanku
u murkacan laakiin u bogsado. 14 Nabad kula dadaala
dadka oo dhan, iyo quduusnaanta aan la'aanteed ninna
Rabbiga arki doonin. 15 Fiiro u yeesha si aan ninna u gaadhi
waayin nimcada Ilaah, waaba intaasoo xidid qadhaadhi soo
baxaa oo idin dhibaa, oo qaar badanu ku nijaasoobaane,
16 si aan dhillay u jirin ama qof cibaado la' sidii Ceesaw
oo ahaa kii curadnimadiisii kala baxay waxoogaa cunto
ah. 17 Waayo, waad og tihiin, xataa kolkuu dabadeedto
jeclaaday inuu dhaxlo barakada, in loo diiday, in kastoo uu
doondoonay, isagoo ilmo daadinaya, waayo, ma uu helin
meel uu ka soo noqdo. 18 Waayo, ma aydnaan iman buurtii
la taaban karay, oo ololaysay, iyo madowgii, iyo gudcurkii,

iyo duufaankii, 19 iyo dhawaaqii buunka, iyo codkii erayada,
oo ahaa codkii ay kuwii maqlay Muuse ka baryeen inaan
eray dambe lagula hadlin. 20 Waayo, uma ay adkaysan karin
wixii lagu amray, markii lagu yidhi, Xataa haddii neef buurta
taabto, waa la dhagxin doonaa. 21 Muuqashadiina cabsi
intay ka qabtay Muuse wuxuu yidhi, Aad iyo aad baan u
cabsanayaa oo waan gariirayaa. 22 Laakiin idinku waxaad
timaadeen Buur Siyoon iyo magaaladii Ilaaha nool oo ah
Yeruusaalemtii jannada, oo waxaad u timaadeen guutooyin
malaa'igo ah oo isu soo ururay, 23 iyo kiniisadda curadyada
oo ku qoran jannada, iyo Ilaaha ah Xaakinka wax kasta, iyo
ruuxyada kuwa qumman oo la kaamilay, 24 iyo Ciise oo
ah dhexdhexaadiyaha axdiga cusub, iyo dhiigga rushaynta
oo u hadla si ka wanaagsan kii Haabiil. 25 Digtoonaada si
aydnaan u diidin kan hadlaya; waayo, haddayan baxsan
kuwii diiday kii dhulka ku waaniyey, si ka badan innaguna
ma baxsan doonno haddaynu ka jeesanno kan jannada
ka hadlaya, 26 kan codkiisii wakhtigaas gariiriyey dhulka;
laakiin hadda wuu ballanqaaday isagoo leh, Weliba mar kale
ayaan gariirin doonaa dhulka, dhulka oo keliyana ma aha ee
xataa samadana waan gariirin doonaa. 27 Erayadii ahaa,
Weliba mar kale, micnehoodu waxaa weeye in la qaadi
doono waxyaalihii la gariiriyey sidii waxyaalo la sameeyey, si
waxyaalihii aan la gariirinu u hadhaan. 28 Sidaas daraaddeed
innagoo helayna boqortooyo aan la gariirin karin, aynu
mahadnaqno si aynu Ilaah uga farxinno innagoo cibaado iyo
cabsi ugu adeegayna; 29 waayo, Ilaaheennu waa dab wax
baabbi'iya.

13 Jacaylka walaalnimadu ha sii jiro. 2 Ha illoobina inaad
shisheeyaha marti qaaddaan, waayo, sidaas qaar baa
malaa'igo u marti qaaday iyagoo aan ogayn. 3 U xusuusta
kuwa xidhan sidii idinkoo iyaga la xidhan, iyo kuwa la silciyey
sidii idinkoo isku jidh ah. 4 Guurka hala wada maamuuso, oo
sariirtuna yeynan nijaasoobin, maxaa yeelay, khaniisiinta iyo
dhillayadaba Ilaah waa xukumi doonaa. 5 Dabiicaddiinnu ha
ahaato mid aan lacag jeclayn, oo waxaad haysataan raalli ku
ahaada, waayo, isaga qudhiisu wuxuu yidhi, Sinaba kuu dayn
maayo, oo sinaba kuu dayrin maayo. 6 Sidaas daraaddeed
innagoo ku kalsoon waxaynu nidhaahnaa, Rabbigu waa
kaalmeeyahayga, oo anigu cabsan maayo; Bal maxaa dad
igu samayn doonaa? 7 Xusuusta hoggaamiyayaashiinna
idiin sheegay ereyga Ilaah. Oo ka fiirsada waxa ka yimaada
asluubtoodii, oo iimaankoodii ku dayda. 8 Ciise Masiix
waa isku mid shalay iyo maanta iyo weligiiba. **(aiōn g165)** 9
Waxbaridda kala duwan oo qalaadu yay idinla tegin, waayo,
waa wanaagsan tahay in qalbigu nimco ku taagnaado ee
uusan ku taagnaan cunto, tan kuwa ku macaamilooday
aanay ku faa'iidin. 10 Waxaynu leennahay meel allabari, oo
kuwa taambuugga ka adeega aanay amar u lahayn inay wax
ka cunaan. 11 Waayo, neefafka dhiiggooda wadaadka sare
keeno meesha quduuska ah dembiga aawadiis jidhadhkooda
waxaa lagu gubaa xerada dibaddeeda. 12 Sidaas daraaddeed
Ciisena si uu dadka quduus ugaga dhigo dhiiggiisa wuxuu
ku xanuunsaday iridda dibaddeeda. 13 Haddaba aynu
isaga ugu tagno xerada dibaddeeda, innagoo qaadayna
caydii la caayay isaga. 14 Waayo, innagu halkan kuma
lihin magaalo sii raagaysa, laakiin waxaynu doondoonaynaa
tan iman doonta. 15 Haddaba xaggiisa aynu had iyo goor
Ilaah ugu bixinno allabariga ammaanta, kaas waxaa weeye
dibnaha magiciisa qirta midhahooda. 16 Laakiinse inaad
wax wanaagsan fashaan oo wax wada wadaagtaan ha
illoobina; waayo, allabaryada caynkaas ah Ilaah aad buu ugu
farxaa. 17 Hoggaamiyayaashiinna addeeca oo ka dambeeya,
waayo, iyagu waxay ilaaliyaan naftiinna sidii iyagoo jawaab
ka bixin doona. Taas farxad ha ku sameeyeen, oo yaanay
qulubsanaan, waayo, taasu waxba idiin tari mayso. 18 Noo
soo duceeya; waayo, waxaannu hubnaa inaannu leennahay
niyo wanaagsan annagoo doonayna inaannu wax kasta si
qumman ugu soconno. 19 Oo aad baan idiinka baryayaa
inaad tan samaysaan, in dhaqso laygu soo kiin celiyo. 20
Haddaba Ilaaha nabadda oo ka soo celiyey kuwii dhintay
Rabbigeenna Ciise oo ah Adhijirka weyn ee idaha, oo ku
soo celiyey dhiigga axdiga weligiis ah, **(aiōnios g166)** 21
kaamil ha idinkaga dhigo wax kasta oo wanaagsan si aad u
samaysaan doonistiisa, oo waxa isaga ka farxiya ha inooga
dhex shaqeeyo Ciise Masiix, kan ammaanta leh weligiis
iyo weligiis. Aamiin. **(aiōn g165)** 22 Walaalayaalow, waxaan
idinka baryayaa inaad u dulqaadataan hadalka waanada ah,
waayo, waxaan idiin soo qoray dhawr eray. 23 Ogaada in
walaalkeen Timoteyos la sii daayay, kan hadduu dhaqso u
yimaado, aannu idin soo wada arki doonno. 24 Igu salaama
kuwa idin hoggaamiya oo dhan, iyo quduusiinta oo dhan.
Kuwa Itaaliya ka yimaadaa way idin soo salaamayaan. 25
Nimco ha idinla jirto kulligiin. Aamiin.

# Yacquub

**1** Yacquub, oo ah addoonkii Ilaah iyo Rabbi Ciise Masiix,
wuxuu salaan gaadhsiinayaa laba iyo tobanka qolo oo
kala firidhsan. **2** Walaalahayow, kolkaad jirrabaaddo kala
cayncayn ah kala kulantaan, kulli farxad u tirsada, **3** idinkoo
og tijaabinta rumaysadkiinnu inay dulqaadasho keento. **4** Oo
dulqaadashadu ha dhammayso shuqulkeeda si aad kaamil u
ahaataan oo aad u dhanaataan, oo aydnaan waxba ugu
baahnaan. **5** Laakiin haddii midkiin xigmad u baahan yahay,
ha ka baryo Ilaah, kan kulli si deeqsinimo ah u siiya isagoo
aan canaanan, oo waa la siin doonaaye. **6** Laakiin rumaysad
ha ku baryo, isagoo aan shakiyayn, waayo, kii shakiyaa
wuxuu la mid yahay hirka badda oo dabayshu kaxayso oo
rogrogto. **7** Ninkaasu yuusan u malayn inuu Rabbiga wax ka
heli doono. **8** Labaqalbiiluhu wuu ka rogrogmadaa socodkiisa
oo dhan. **9** Walaalkii hooseeyaa ha ku faano sarraysiintiisa,
**10** kii taajir ahuna ha ku faano hoosaysiintiisa, waayo,
wuxuu u idlaan doonaa sida ubaxa cawska. **11** Qorraxdu
waxay la soo baxdaa kulaylka, wayna engejisaa cawska, oo
ubaxiisuna wuu daataa, quruxda midabkiisuna way ka luntaa;
sidaas oo kale ayaa taajirku ugu lumi doonaa socodkiisa. **12**
Waxaa barakaysan ninka jirrabaadda u sii adkaysta, waayo,
goortii loo bogo, wuxuu heli doonaa taajka nolosha kan Ilaah
u ballanqaaday kuwa isaga jecel. **13** Midna yuu odhanin
kolkii la jirrabo, Xagga Ilaah baa layga jirrabay. Waayo, Ilaah
laguma jirrabo shar, isaguna midna ma jirrabo. **14** Mid kasta
waxaa jirraba damaciisa sharka ah isagoo la jiidanayo oo la
sasabayo. **15** Dabadeed damacu kolkuu uuraysto wuxuu
dhalaa dembi, dembiguna kolkuu weynaado wuxuu keenaa
dhimasho. **16** Yaan laydin khiyaanayn, walaalahayga aan
jeclahayow. **17** Hadiyad kasta oo wanaagsan iyo hibo kasta
oo kaamil ah kor bay ka timaadaa iyadoo ka soo degaysa
xagga Aabbaha nuurarka isagoo aan lahayn rogrogmad ama
hoos laallaabasho. **18** Isagoo doonaya ayuu hadalka runta
ah inagu dhalay si aynu u noqonno midhaha ugu horreeya
oo uunkiisa. **19** Waad garanaysaan tan, walaalahayga aan
jeclahayow. Laakiin nin walba ha u dhaqsado maqlinta,
oo ha u gaabiyo hadalka, cadhadana ha u gaabiyo; **20**
waayo, dad cadhadiisu ma keento xaqnimada Ilaah. **21**
Sidaas daraaddeed iska fogeeya wasakhnimada oo dhan
iyo badnaanta xumaanta; oo qabownimo ku qaata hadalka
laydinku tallaalay, kan naftiinna badbaadin kara. **22** Noqda
kuwa hadalka yeela, oo ha ahaanina kuwa maqla oo keliya
oo nafsaddooda khiyaaneeya. **23** Waayo, haddii mid yahay
kan hadalka maqla oo keliya, oo uusan ahayn kan yeela,
wuxuu la mid yahay nin wejiga abuuristiisa muraayad ku
fiirinaya. **24** Waayo, wuu isfiiriyaa, oo iska tagaa, oo markiiba
is-illoobaa siduu ahaa. **25** Laakiin kii fiiriya sharciga kaamilka
iyo xorriyadda ah oo ku sii socda, isagoo aan ahayn kan
maqla oo illooba laakiin kan shuqulka yeela, kaasu waa ku
barakaysnaan doonaa yeeliddiisa. **26** Haddii mid isu maleeyo
inuu cibaado badan yahay, oo uusan afkiisa xakamayn,
laakiin uu qalbigiisa khiyaaneeyo, kaas cibaadadiisu waa
wax aan waxtar lahayn. **27** Cibaado daahir ah oo aan
nijaas lahayn Ilaaha Aabbaha ah hortiisa waxay tahay in la
xannaaneeyo agoonta iyo carmallada markay dhib ku jiraan,
iyo in layska dhawro wasakhda dunida.

**2** Walaalahayow, iimaanka Rabbigeenna Ciise Masiix kan
ammaanta leh eexasho ha ku haysanina. **2** Haddii nin
kaatun dahab ah iyo dhar quruxsan qabaa shirkiinna soo
galo, oo haddana haddii nin kale oo miskiin ah oo dhar
uskag leh qabaa soo galo, **3** oo aad fiirisaan ka dharka
quruxdasan qaba oo aad ku tidhaahdaan, Adigu kaalay
oo halkan wanaagsan fadhiiso, oo aad ku tidhaahdaan ka
miskiinka ah, Adigu xaggaas istaag ama halkan cagahayga
ag fadhiiso, **4** miyeydnaan kala qaybsamin oo miyeydnaan
noqonin kuwa fikirrada sharka leh wax ku xukuma? **5** I
dhegaysta, walaalahayga aan jeclahayow. Miyaan Ilaah u
dooran kuwa ah masaakiinta xagga dunida inay ahaadaan
kuwa hodan ku ah rumaysadka oo dhaxla boqortooyaduu
u ballanqaaday kuwa isaga jecel? **6** Laakiin idinku waad
maamuus jebiseen miskiinkii. Taajiriintu miyaanay idin dulmin
oo miyaanay idiin jiidin maxkamadda? **7** Miyaanay caayin
magaca wanaagsan oo laydiinku yeedhay? **8** Haddaba
haddaad oofisaan sharciga boqornimada siduu Qorniinku
leeyahay, Waa inaad deriskaaga u jeclaataa sida naftaada,
si wanaagsan baad yeeshaan. **9** Laakiin haddaad dadka
u kala eexataan waad dembaabtaan, oo sharcigu wuu
idinku caddeeyey inaad tihiin kuwa xadgudbay. **10** Ku alla
kii sharciga oo dhan xajiya oo qaynuun keliya ku gafa,
kulli wuu ku eedaysan yahay. **11** Waayo, kii yidhi, Ha
sinaysan; wuxuu kaloo yidhi, Cidna ha dilin. Haddaanad
sinaysanin laakiin aad dad disho, waxaad noqotay ku
sharciga ku xadgudbay. **12** Sidii kuwo sharciga xorriyadda
lagu xukumi doono, u hadla oo u yeela. **13** Xukunku naxariis
uma leh kii aan dadka u naxariisan; naxariistu way ka
faantaa xukunka. **14** Maxay tartaa, walaalahayow, haddii
nin yidhaahdo, Rumaysad baan leeyahay, laakiin aanu
shuqullo lahayn? Rumaysadku ma badbaadin karaa isaga?
**15** Walaal wiil ah ama walaal gabadh ah hadday arradan
yihiin oo cuntadii maalinta u baahan yihiin, **16** oo midkiin ku
yidhaahdo iyaga, Nabad gala, diirsada oo dherga, oo weliba

aydnaan siin waxa jidhku u baahan yahay, maxay tartaa? 17
Haddaba sidaas oo kale rumaysadku haddaanu shuqullo
lahayn keli ahaantiisu waa meyd. 18 Laakiin waxaa la odhan
doonaa, Adigu waxaad leedahay rumaysad, anna waxaan
leeyahay shuqullo. I tus rumaysadkaaga aan shuqullada
lahayn, anna rumaysadkayga shuqulladaydaan kugu tusi
doonaa. 19 Waad rumaysan tahay in Ilaah yahay mid keliya.
Taas waad ku wanaagsan tahay. Xataa jinniyaduna sidaas
way rumaysan yihiin, wayna gariiraan. 20 Doqonow, ma
doonaysaa inaad garatid in rumaysadka aan shuqullada
lahaynu aanu waxba tarin? 21 Miyaan awowgeen Ibraahim
shuqullo lagu caddaynin inuu xaq yahay goortuu wiilkiisii
Isxaaq meeshii allabariga ku bixiyey? 22 Waad garanaysaa
in rumaysadku shuqulladiisii la shaqeeyey, oo rumaysadku
kaamil ku noqday shuqullada. 23 Waxaa rumoobay Qorniinka
leh, Ibraahimna Ilaah buu rumaystay, oo waxaa isaga loogu
tiriyey xaqnimo, oo waxaa loogu yeedhay saaxiibkii Ilaah. 24
Waxaad garanaysaan in nin shuqullo lagu caddeeyo inuu
xaq yahay oo aan lagu caddayn rumaysadka oo keliya. 25
Sidaas oo kale miyaan dhilladii Raxab ahayd shuqullo lagu
caddayn inay xaq tahay kolkay soo dhowaysay basaasyadii
oo ay jid kale u dirtay? 26 Sida jidhkii aan ruux lahaynu
meyd u yahay, sidaas oo kaluu rumaysadkii aan shuqullo
lahaynuna meyd u yahay.

**3** Macallimiin badan ha noqonina, walaalahayow, idinkoo
garanaya inaynu heli doonno xukun ka sii weyn. 2 Waayo,
dhammaanteen wax badan baynu ku gafnaa. Haddii nin
ku gafi waayo hadalka, kaasu waa nin kaamil ah, wuuna
xakamayn karaa jidhka oo dhan. 3 Haddaba haddaynu
fardaha afkooda xakame gelinno inay ina addeecaan,
jidhkooda oo dhanna waynu jeedinnaa. 4 Ogaada, xataa
doonniyaha, in kastoo ay waaweyn yihiin, oo dabaylo
waaweynu kaxeeyaan, weliba waxaa loogu jeediyaa shukaan
aad u yar meeshii ninka wada qushigiisu doonayo. 5 Sidaas
oo kalena carrabku waa qayb yar, waxyaalo waaweyn
buuna ku faanaa. Bal eega dab yaru intuu qoryo shido. 6
Carrabkuna waa dab, waana dunida xaqdarrada. Carrabku
wuxuu ku dhex jiraa xubnaheenna, waana kan wasakheeya
jidhka oo dhan oo ololiya orodka abuurista, oo jahannamadu
isagay ololisaa. **(Geenna g1067)** 7 Cayn walba oo ah dugaag,
iyo haad, iyo waxa bogga ku gurguurta, iyo waxa badda
ku jiraba waa la rabbeeyaa, oo waxaa lagu rabbeeyey
dabiicadda dadka. 8 Laakiin ninna ma rabbayn karo carrabka;
waa shar rogrogmada, oo waxaa ka buuxda sunta wax
disha. 9 Isla isagaynu ku ammaannaa Rabbiga iyo Aabbaha,
oo isla isagaynu ku habaarnaa dadka Ilaah ekaantiisa laga
abuuray. 10 Isku af baa waxaa ka soo baxa ammaan iyo
habaar. Walaalahayow, waxyaalahanu waa inaanay sidaas
noqon. 11 Ishu miyey isku meel ka soo wada daysaa
biyo macaan iyo kuwa qadhaadh? 12 Walaalahayow, geed
berde ahu miyuu dhali karaa saytuun, ama geed canab ahu
miyuu dhali karaa midho berde ah? Sidaas oo kalena biyo
dhanaanu macaan ma ay noqon karaan. 13 Kumaa idinku
dhex jira oo xigmad iyo waxgarasho leh? Shuqulladiisa ha
ku muujiyo dabiicaddiisa wanaagsan, isagoo leh qabowga
xigmadda. 14 Haddaad xaasidnimo qadhaadh iyo iskala
qaybqaybin ku haysataan qalbigiinna, ha faanina, runtana
been ha ka sheegina. 15 Xigmaddaasu ma aha tan kor ka
soo degta, laakiin waa tan dhulka iyo nafta iyo jinniyada.
16 Waayo, meeshii xaasidnimo iyo iskala qaybqaybinu ku
jiraan, meeshaas waxaa ku jira iskuqasnaan iyo falniin kasta
oo shar leh. 17 Laakiin xigmaddii kor ka timaadaa horta waa
daahir, dabadeedna waa nabad iyo qabow iyo mid si dhib
yar loola heshiiyo, oo waxaa ka buuxa naxariis iyo midho
wanaagsan, mana leh u-kala-eexasho ama labaweji. 18
Midhaha xaqnimada nabad waa loogu beeraa kuwa nabadda
ka shaqeeya.

**4** Dagaallada iyo dirirta idinku dhex jira xaggee bay ka
yimaadaan? Miyaanay ka imanin damacyadiinna ku
dhex dagaallamaya xubnihiinna? 2 Waad damacdaan,
mana lihidin; waad dishaan, waadna xaasiddaan, mana heli
kartaan; waad dirirtaan, waadna dagaallantaan, mana lihidin,
waayo, ma aad weyddiisataan. 3 Waad weyddiisataan, mana
heshaan, waayo, si xun baad u weyddiisataan inaad ku
bixisaan damacyadiinna aawadood. 4 Dhillayo iyo dhillooyin
yahow, miyeydnaan garanayn inay saaxiibnimada dunidu
Ilaah la col tahay? Sidaas daraaddeed kii kasta oo doonaya
inuu saaxiib la ahaado dunida, Ilaah buu la col noqdaa. 5
Mise waxaad u malaynaysaan in Qorniinku micnela'aan ku
hadlo, Ruuxa uu ka dhigay inuu ina dhex joogo ayaa aad
iyo aad inoo jecel isagoo inoo masayra? 6 Laakiin isagu
wuxuu bixiyaa nimco badan oo badan. Haddaba Qorniinku
wuxuu leeyahay, Ilaah waa hor joogsadaa kuwa kibra, laakiin
kuwa is-hoosaysiiya ayuu nimco siiyaa. 7 Haddaba Ilaah
ka dambeeya, laakiin Ibliiska hor joogsada, wuu idinka
carari doonaaye. 8 U soo dhowaada Ilaah, isaguna wuu
idiin soo dhowaan doonaa. Dembilayaashow, gacmihiinna
nadiifiya. Labaqalbiilayaashow, qalbiyadiinna daahiriya. 9
Dhibtooda oo baroorta oo ooya. Qosolkiinnu baroor ha u
rogmado, farxaddiinnuna caloolxumo. 10 Is-hoosaysiiya
Rabbiga hortiisa, isna wuu idin sarraysiin doonaa. 11
Xumaan ha iskaga hadlina, walaalayaalow. Kii xumaan

walaalkiis kaga hadlaa ama walaalkiis xukumaa, sharciga
ayuu xumaan kaga hadlaa, sharcigana wuu xukumaa.
Haddaad sharciga xukuntid, adigu ma ihid mid sharciga
yeela, laakiin waxaad tahay mid isaga xukuma. 12 Waa
mid keliya kan sharciga bixiyaa oo wax xukumaa, oo
waa kan kara inuu wax badbaadiyo oo uu wax dumiyo.
Laakiin adigu yaad tahay, kan deriskiisa xukumow? 13
Bal kaalaya hadda, kuwiinnan yidhaahda, Maanta ama
berri waxaannu tegi doonaa magaalo, oo halkaasaannu
sannad joogi doonnaa, waannu baayacmushtari doonnaa
oo faa'iidaysan doonnaa, 14 kuwiinnan aan garanaynin
waxa berri dhici doona. Noloshiinnu waa maxay? Waayo,
idinku waxaad tihiin ceeryaamo, tan wakhti yar muuqata
dabadeedna libidha. 15 Waa inaad tidhaahdaan, Haddii
Rabbigu doonayo, waannu noolaan doonnaa oo waxaannu
samayn doonnaa tan ama taas. 16 Laakiin idinku haatan
waxaad ku faanaysaan isla weynaantiinna. Faanka caynkaas
ah oo dhammu waa shar. 17 Haddaba kii garanaya inuu
wax wanaagsan sameeyo laakiin aan samayn, dembi bay u
tahay isaga.

**5** Bal kaalaya hadda, kuwiinnan taajiriinta ahow, ooya
oo ka baroorta dhibaatooyinka idinku soo degaya. 2
Duunyadiinnii way qudhuntay, dharkiinniina aboor baa
cunay. 3 Dahabkiinnii iyo lacagtiinniiba way mirdheen,
miridhkooduna markhaati buu idinku noqon doonaa, wuxuuna
jidhkiinna u cuni doonaa sida dabka oo kale. Maal baad u
urursateen maalmaha ugu dambeeya. 4 Shaqaalayaashii
beerihiinnii idiin gooyay mushahaaradoodii aad dulmiga uga
reebateen way dhawaaqaysaa, qaylooyinkii kuwii beerihii
gooyayna waxay galeen dhegaha Rabbiga Saba'ood. 5
Dhulkaad ku barwaaqaysateen, waadna ku raaxaysateen,
oo qalbiyadiinnii waxaad u naaxiseen maalinta gowracidda.
6 Waad xukunteen, waadna disheen kan xaqa ah. Isaguna
isma kiin hor taago. 7 Haddaba, walaalayaalow, dulqaata ilaa
imaatinka Rabbiga. Bal ogaada, ninka beerrey ahu wuxuu
sugaa midhaha qiimaha leh ee dhulka, isagoo u dulqaata
ilaa uu helo roobka hore iyo kan dambe. 8 Idinkuna dulqaata,
qalbiyadiinnana xoogeeya, waayo, imaatinka Rabbigu wuu
dhow yahay. 9 Ha iska cabanina, walaalayaalow, yaan laydin
xukumine. Bal ogaada, xaakinku albaabbada hortooduu
taagan yahaye. 10 Walaalayaalow, u qaata tilmaan dhibaato
iyo dulqaadasho ah nebiyadii ku hadlay magaca Rabbiga. 11
Bal ogaada! Waxaynu ugu yeedhnaa kuwo barakaysan kuwii
adkaystay. Waad maqasheen adkaysashadii Ayuub, waadna
aragteen dhammaadkii qasdiga Rabbiga, waayo, Rabbigu
waa raxmad badan yahay, naxariisna wuu leeyahay. 12
Laakiin wax walba hortood, walaalahayow, ha dhaaranina;
ha ku dhaaranina jannada, ama dhulka, ama dhaar kale;
haahdiinnu haah ha ahaato, mayadiinnuna maya ha ahaato,
yeydnan ku dhicin xukun hoostiis. 13 Mid dhibaataysanu ma
idinku dhex jiraa? Ha ducaysto. Mid faraxsanu ma jiraa? Ha
gabyo. 14 Mid bukaa ma idinku dhex jiraa? Ha u yeedho
waayeellada kiniisadda, oo iyagu ha u duceeyeen, oo saliid
ha ku mariyeen magaca Rabbiga. 15 Ducadii rumaysad
lahu way bogsiin doontaa kii buka, oo Rabbigu waa sara
kicin doonaa, oo hadduu dembaabay waa loo dembidhaafi
doonaa. 16 Midkiinba midka kale dembiyadiisa ha u qirto oo
ha u duceeyo si aad u bogsataan. Nin xaq ah baryadiisa
shaqaysa wax badan bay kartaa. 17 Eliyaas wuxuu ahaa nin
dabiicaddeenna oo kale leh. Aad buu Ilaah u baryay inaan
roob di'in, roobna saddex sannadood iyo lix bilood dhulka
kuma uu di'in. 18 Oo kol kale ayuu Ilaah baryay, oo cirku
roob buu soo daayay, dhulkuna midhihiisii buu soo saaray.
19 Walaalahayow, haddii midkiin ka leexdo runta, oo mid soo
celiyo isaga, 20 ogaada in kii dembilaha qaladka jidkiisa ka
soo celiyaa uu dembilihii naftiisa dhimasho ka badbaadin
doono oo uu dembiyo badan qarin doono.

# 1 Butros

1 Anigoo ah Butros oo ah rasuulkii Ciise Masiix waxaan
warqaddan u qorayaa qariibbada ku kala firidhsan
Bontos, iyo Galatiya, iyo Kabbadokiya, iyo Aasiya, iyo
Bituniya, 2 oo lagu doortay aqoontii Ilaaha Aabbaha ahu
hore u sii ogaa, oo quduus lagaga dhigay Ruuxa, xagga
addeecidda iyo rushaynta dhiiggii Ciise Masiix. Nimco iyo
nabadu ha idiin bateen. 3 Ammaanu ha u ahaato Ilaaha ah
Aabbaha Rabbigeenna Ciise Masiix. Naxariistiisa badan
aawadeed ayuu mar kale ina dhalay inaynu rajo nool ku
helno sarakiciddii Ciise Masiix ka soo sara kacay kuwii
dhintay, 4 oo aynu helno dhaxal aan dhammaanayn, oo
aan nijaasoobayn, oo aan baabba'ayn, oo jannada laydiinku
kaydiyey. 5 Idinku waxaad tihiin kuwo xoogga Ilaah iyo
rumaysadka lagu dhawro ilaa badbaadada diyaarka u ah
in wakhtiga ugu dambaysta la muujiyo. 6 Taas waad ku
faraxsan tihiin in kastoo, haddii ay waajib tahay, aad haatan
wakhti yar ku murugootaan jirrabaaddo badan oo kala
cayncayn ah. 7 Si loo tijaabiyo rumaysadkiinna, oo aad
uga sii qaalisan dahabka oo ah wax baabba'a in kastoo
dab lagu tijaabiyo. Markaasaa laga helayaa mahad iyo
ammaan iyo ciso markii Ciise Masiix la muujiyo. 8 Isaga ma
aydin arkin, waadse jeceshihiin, hadda in kastoo aydnaan
arkin, waadse rumaysan tihiin, oo waxaad ku faraxdaan
farxad aan la sheegi karin oo ammaan leh. 9 Waxaadna
helaysaan waxa rumaysadkiinnu ku dhammaado oo ah
badbaadada naftiinna. 10 Nebiyadii sii sheegay nimcada
idiin imanaysa waxay doondooneen oo aad u raadiyeen wax
ku saabsan badbaadadaas. 11 Waxayna raadiyeen wixii iyo
wakhtigii Ruuxii Masiixa oo iyaga ku jiray uu u tilmaamay
markuu horay uga sii markhaati furay waxyaalaha Masiixu
ku xanuunsan doono iyo waxyaalaha ammaanta ah oo iyaga
ka daba iman doona. 12 Oo waxaa iyagii loo muujiyey
inaanay iyagu isugu adeegin waxyaalahaas, laakiinse idinkay
idiinku adeegeen, oo waxyaalahaas waxaa idin ogaysiiyey
kuwii injiilka idinkaga wacdiyey Ruuxa Quduuska ah ee
jannada laga soo diray; waxyaalahaas oo ay malaa'iguhuna
jecel yihiin inay fiiriyaan. 13 Haddaba isku giijiya guntiga
maankiinna, dhug yeesha, oo aad u rajeeya nimcada laydiin
keeni doono markii Ciise Masiix la muujiyo. 14 Idinkoo
ah carruur addeec leh ha raacina damacyadiinnii hore oo
aad ku samayseen jaahilnimadiinnii; 15 laakiinse siduu
kan idiin yeedhay quduuska u yahay, idinkuna sidaas oo
kale dabiicaddiinna oo dhan quduus ku ahaada, 16 maxaa
yeelay, waxaa qoran, Idinku waa inaad quduus ahaataan,
waayo, aniguba quduus baan ahay. 17 Haddaad Aabbow
ugu yeedhaan kan nin walbaba u xukuma eexashola'aan iyo
sida shuqulkiisu yahay, cabsi Ilaah isku dhaafiya wakhtiga
aad qariibka tihiin. 18 Waxaad og tihiin inaan dabiicaddiinnii
bilaashka ahayd oo aad awowayaashiin ka dhaxasheen
laydinkaga soo furan waxyaalaha baabba'aya oo ah sida
lacagta iyo dahabka, 19 laakiinse waxaa laydinku soo furtay
dhiiggii qaaliga ahaa oo Masiix oo ah sidii wan yar oo
aan wax ceeb ah iyo iin toona lahayn. 20 Isaga horaa
loo yiqiin intaan dunida la aasaasin, laakiinse wakhtiyadii
dhammaadkoodii ayaa loo muujiyey idinka aawadiin, 21
idinkoo isaga aawadiis ku ah kuwa rumaysan Ilaaha isaga
ka soo sara kiciyey kuwii dhintay oo ammaanay isaga, in
rumaysadkiinna iyo rajadiinnu ay Ilaah ku xidhnaadaan
aawadeed. 22 Sidaad naftiinna u daahiriseen markaad
addeecdeen runta xagga jacaylka walaalnimada oo aan
iska yeelyeel ahayn, aad iyo aad qalbiga isaga jeclaada.
23 Idinka mar kale laydinkuma dhalin abuur baabba'aya,
laakiinse waxaa laydinku dhalay abuur aan baabba'ayn oo
ah erayga Ilaah oo nool oo waara. (aiōn g165) 24 Waayo, Wax
kasta oo jiidh lahu waa sida caws oo kale, Oo quruxdiisa
oo dhammuna waa sida ubaxa duurka oo kale, Haddaba
cawsku wuu engegaa, ubaxuna wuu dhacaa; 25 Laakiinse
erayga Rabbigu weligiisba wuu waaraa. Haddaba kaasu waa
eraygii warka wanaagsanaa oo laydinku wacdiyey. (aiōn g165)

2 Haddaba sidaas daraaddeed iska wada fogeeya xumaan
oo dhan, iyo khiyaano oo dhan, iyo labawejiilenimo,
iyo hinaaso, iyo cay oo dhan, 2 oo sida carruur dhallaan
ah u jeclaada caanaha ruuxa ee saafiga ah, si aad ugu
kortaan xagga badbaadada, 3 haddii aad dhadhamiseen in
Rabbigu raxmad leeyahay, 4 kaas oo aad u imanaysaan,
oo ah dhagax nool, oo dadku diiday, laakiin xagga Ilaah
laga doortay oo qaali ah. 5 Idinkuna sida dhagaxyo noolnool
ayaa waxaa laydinka dhisayaa guri ruux ah inaad ahaataan
wadaaddo quduus ah si aad xagga ruuxa uga bixisaan
allabariyo uu Ilaah ku aqbalo Ciise Masiix. 6 Maxaa yeelay,
waxaa Qorniinku leeyahay, Bal eega, waxaan Siyoon dhex
dhigayaa dhagax geeseed oo weyn, oo la doortay, oo
qaali ah, Oo kii isaga rumaystaa ma ceeboobi doono. 7
Haddaba sidaas daraaddeed qaalinimada waxaa leh idinkoo
ah kuwa rumaysan, laakiinse xagga kuwa aan rumaysnayn,
Dhagaxii kuwa wax dhisa ay diideen, Wuxuu noqday
madaxa rukunka; 8 iyo Dhagax lagu turunturoodo oo ah
dhadhaab lagu xumaado; waayo, waxay ku turunturoodaan
ereyga, maxaa yeelay, ma addeecsana; taas oo ah wixii loo
xugmay. 9 Laakiinse idinku waxaad tihiin jinsi la doortay,
iyo wadaaddada boqorka, iyo quruun quduus ah, iyo dad

Ilaah iska leeyahay, inaad ogeysiisaan wanaagga kan
gudcurka idiinka yeedhay oo idiinku yeedhay xagga nuurkiisa
yaabka leh. 10 Idinku waagii hore dad ma aydin ahayn,
laakiinse haatan waxaad tihiin dadka Ilaah, idinku markii
hore naxariis ma aydin helin, laakiinse haatan naxariis
baad hesheen. 11 Gacaliyayaalow, waxaan idiin baryayaa,
idinkoo ah sidii qariib iyo dad sodcaal ah, inaad ka fogaataan
damacyada jidhka oo nafta la dagaallama. 12 Quruumaha
dhexdooda dabiicad wanaagsan ku dhaqma, in meeshii
ay wax xun idinkaga sheegi lahaayeen sidii idinkoo ah
kuwo xumaan fala, ay shuqulladiinna wanaagsan oo ay
arkaan Ilaah ku ammaanaan maalinta booqashada. 13
Rabbiga daraaddiis u addeeca amar kasta oo dadka, ama
ha ahaado boqorka ka sarreeya dadka oo dhan, 14 amase
taliyayaasha uu isagu u soo diray inay ka aargutaan kuwa
xumaanta sameeya oo ay ammaanaan kuwa samaanta fala.
15 Waayo, Ilaah doonistiisu waxa weeye inaad samafalid
ku aamusiisaan jaahilnimada nacasyada, 16 idinkoo xor ah
oo aan xorriyaddiinna ugu isticmaalayn sidii jubbad aad
xumaanta ku qarisaan, laakiinse sidii idinkoo ah addoommo
Ilaah. 17 Dadka oo dhan maamuusa, walaalahana jeclaada,
Ilaahna ka cabsada, oo boqorka ciseeya. 18 Midiidinyadow,
ka cabsada oo ka dambeeya sayidyadiinna, mana aha kuwa
wanaagsan oo idiin roon oo keliya, laakiinse xataa kuwa
qalloocan. 19 Waayo, tanu waa wax loo bogo haddii nin
niyada xagga Ilaah uga adkaysto dhibaatooyinka, isagoo
xaqdarro ku xanuunsanaya. 20 Markii aad dembaabtaan, oo
laydin garaaco, haddii aad u dulqaadataan, maxay ammaan
leedahay? Laakiinse markaad wanaag fashaan oo aad
xanuunsataan, haddii aad u dulqaadataan, taasu waa wax
Ilaah u bogo. 21 Waayo, taasu waa wixii laydiinku yeedhay,
maxaa yeelay, Masiix baa idiin xanuunsaday, oo wuxuu
idinkaga tegey masaal inaad tallaabooyinkiisa raacdaan.
22 Isagu ma uu dembaabin, khiyaanona afkiisa lagama
helin. 23 Oo isagu markii la caayay, dadkii caayay cay
uma uu celin. Markuu xanuunsadayna ninna ma uu cabsiin,
laakiinse wuxuu isu dhiibay kan xaqnimada wax ku xukuma.
24 Oo isagu dembiyadeennii wuxuu ku qaaday jidhkiisii
geedka saarnaa, si innagoo dembi kala dhimannay aynu
xaqnimo ugu noolaanno. Waxaad ku bogsateen xariijimihii
karbaashiddiisii. 25 Waayo, waxaad u ambanayseen sida ido
oo kale, laakiinse haatan waxaad u soo noqoteen Adhijirka
iyo Hoggaamiyaha naftiinna.

**3** Sidaas oo kalena, dumar yahow, nimankiinna ka
dambeeya in xataa haddii qaar uusan erayga addeecin
ay erayga la'aantiis ku soo hanuunsamaan dabiicadda
afooyinkooda, 2 markay arkaan dabiicaddiinna daahirsan
ee cabsida leh. 3 Isqurxintiinnu yaanay ahaan tan dibadda
ah, oo ah timo tidcan, iyo dahab layska lulo, amase dhar
la xidho, 4 laakiinse ha ahaato inta qalbiga ee qarsoon,
taasoo leh wax aan baabba'ayn ee ah ruuxa qabow oo
aamusan, kaasoo Ilaah hortiisa qiimo badan ku leh. 5
Waayo, sidaasoo kalaa waagii hore dumarkii quduuska ahaa
oo Ilaah wax ka rajayn jiray ay isu qurxin jireen, iyagoo
nimankoodii ka dambeeya. 6 Saarahba sidaasoo kalay
Ibraahim u addeeci jirtay, oo ay ugu yeedhi jirtay, Sayidow;
oo idinna haddii aad wanaag fashaan oo aydnaan ka cabsan
wixii argaggax leh waxaad tihiin carruurteeda. 7 Nimankow,
idinkuna sidaas oo kale afooyinkiinna aqoon kula dhaqma
sidii iyagoo ah weel tabardaran, oo iyaga maamuusa sida
kuwa idinla dhaxla nimcada nolosha, si aan baryadiinna loo
hor joogsan. 8 Ugu dambaysta, waxaan idinku leeyahay,
Kulligiin isku maan ahaada, oo isu jixinjixa, oo sida walaalo
isu jeclaada, oo isu naxariista, oo is-hoosaysiiya. 9 Shar
shar ha ka celinina, cayna cay ha ka celinina, laakiinse
duco ka celiya, maxaa yeelay, saas aawadeed waxaa
laydiinku yeedhay inaad barako dhaxashaan, waayo, 10 Kii
doonaya inuu nolol jeclaado, Oo arko maalmo wanaagsan,
Carrabkiisa shar ha ka joojiyo, Bushimihiisana yaanay
khiyaano ku hadlin. 11 Oo ha ka leexdo shar, oo wanaag
ha sameeyo; Nabad ha doondoono oo ha raacdaysto; 12
Waayo, Rabbiga indhihiisu waxay fiiriyaan kuwa xaqa ah,
Dhegihiisuna waxay u furan yihiin baryadooda; Laakiin
wejiga Rabbigu waa ka gees kuwa sharka sameeya. 13
Haddii aad waxa wanaagsan ku dadaashaan, bal yaa wax
idin yeeli doona? 14 Laakiinse xaqnimada daraaddeed haddii
aad u xanuunsataan, waad barakaysan tihiin. Haddaba ha
ka cabsanina cabsigelintooda, hana welwelina. 15 Rabbiga
Masiixa ah qalbiyadiinna quduus kaga dhiga, oo mar kasta
diyaar u ahaada inaad u jawaabtaan nin alla ninkii wax idinka
weyddiiya sabab ku saabsan rajada aad leedihiin, laakiinse
qabow iyo cabsi ugu jawaaba, 16 idinkoo qalbi wanaagsan
leh, in markii wax xun laydinka sheego, ay ceeboobaan
kuwa caaya dabiicaddiinna wanaagsan ee xagga Masiixa
ah. 17 Waayo, haddii ay doonista Ilaah tahay, waxaa ka
wanaagsan inaad samafalidda u xanuunsataan intii aad
u xanuunsan lahaydeen sharfalidda. 18 Maxaa yeelay,
Masiixba mar buu u xanuunsaday dembiyada. Isagoo xaq
ah ayuu u xanuunsaday kuwa aan xaqa ahayn aawadood
inuu inoo keeno Ilaah. Xagga jidhka waa laga dilay, laakiinse
xagga ruuxa waa laga nooleeyey. 19 Ruuxii ayuu ku tegey
oo wuxuu wacdiyey ruuxyadii xabsigii ku jiray, 20 kuwaas oo
waagii hore ahaa caasiyiin markii dulqaadashada Ilaah ay

sugaysay intii maalmihii Nuux oo la diyaarinayay doonnidii, taasoo ay biyihii kaga badbaadeen dhawr qof oo ah siddeed nafood oo keliya. **21** Biyahaasuna waxay ka dhigan yihiin baabtiiska hadda idinku badbaadiya sarakicidda Ciise Masiix, oo aan ahayn ka fogaynta wasakhda jidhka, laakiinse waxaa weeye baryo ka timaada qalbi wanaagsan oo xagga Ilaah. **22** Ciise Masiix jannaduu galay oo wuxuu joogaa gacanta midigta oo Ilaah, oo malaa'igaha iyo kuwa amarka leh iyo kuwa xoogga leh oo dhanba waa laga hoosaysiiyey isaga.

**4** Mar haddii Masiixu jidhka ku xanuunsaday, idinkuna sidaas oo kale isu diyaariya, idinkoo isku maan ah; maxaa yeelay, kii jidhka ku xanuunsaday waa ka joogsaday dembiga, **2** si wakhtiga idiin hadhay oo aad jidhka ku nooshihiin aydnaan damacyada dadka mar dambe ugu noolaan, laakiinse aad ugu noolaataan doonista Ilaah. **3** Waayo, waxaa idinku filan wakhtigii hore oo aad doonistii dadka aan Ilaah aaminin samayn jirteen, markii aad ku socon jirteen nejisnimo, iyo damacyadii jidhka, iyo sakhraannimo, iyo rabshad, iyo khamricabbid, iyo sanamcaabudid xaaraan ah. **4** Oo markii aydnaan iyaga u raacin nejisnimadaas badan, way idinla yaabaan oo way idin caayaan. **5** Iyagu waxay faleen waxay kala xisaabtami doonaan kan diyaarka u ah inuu xukumo kuwa nool iyo kuwa dhintayba. **6** Waayo, taas aawadeed injiilka waxaa lagu wacdiyey xataa kuwii dhintay in iyaga jidhka lagu xukumo sida dadka, laakiinse ay ruuxa ku noolaadaan sida Ilaah. **7** Haddaba wax walba dhammaadkoodu wuu dhow yahay, sidaas daraaddeed digtoonaada, oo tukashada u feeyignaada. **8** Wax walba hortood idinku aad isu jeclaada, maxaa yeelay, jacaylku wuxuu qariyaa dembiyo faro badan. **9** Ismartiqaada gunuunacla'aan. **10** Sida mid waluba u helay hadiyad, idinku isu adeega, sida wakiillo wanaagsan oo helay nimcada Ilaah ee badan ee kala cayncaynka ah. **11** Haddii nin hadlo, ha u hadlo sidii isagoo ku hadlaya ereyga Ilaah; haddii nin adeegona, ha u adeego siduu Ilaah xoogga u siiyo, in wax walbaba Ilaah ku ammaanmo Ciise Masiix, kaasoo weligiis iyo weligiisba leh ammaanta iyo dowladnimadaba. Aamiin. **(aiōn g165)** **12** Gacaliyayaalow, ha la yaabina jirrabaadda dabka ah oo idinku dhex dhacday in laydiin tijaabiyo sida iyadoo ay idinku dhaceen wax la yaab lihi. **13** Laakiinse sidaad u tihiin kuwo ka qayb qaatay waxyaalaha Masiixu ku xanuunsaday, farxa, inaad farxad aad u weyn ku faraxdaan marka ammaantiisa la muujiyo. **14** Haddii magaca Masiix aawadiis laydin caayo, waad barakaysan tihiin, maxaa yeelay, waxaa idin dul jooga Ruuxa ammaanta oo ah Ruuxa Ilaah. **15** Haddaba midkiinna yuusan u xanuunsan sida isagoo ah gacankudhiigle, ama tuug, ama sharfale, ama mid faraggeliya axwaasha dadka kale. **16** Laakiin haddii nin u xanuunsado sida isagoo Masiixi ah, yaanu ceebsan, laakiinse Ilaah ha ku ammaano magacan. **17** Waayo, waxaa la gaadhay wakhtigii dadka Ilaah xukunka laga bilaabi lahaa, oo haddii innaga marka hore laynaga bilaabo, kuwa aan injiilka Ilaah addeecin muxuu aakhirkoodu ahaan doonaa? **18** Haddaba haddii kan xaqa ahu si dhib leh ku badbaado, xaggee bay ka muuqan doonaan cibaadalaawaha iyo dembiluhu? **19** Sidaas daraaddeed kuwa doonista Ilaah u xanuunsada, iyagoo samafalaya, naftooda ammaano ha ugu dhiibeen Abuuraha aaminka ah.

**5** Anigoo anba oday la ah oo marag ka ah waxyaalihii Masiixu ku xanuunsaday oo weliba ka qayb qaadanaya ammaanta la muujin doono, waxaan ku waaninayaa odayaasha idinku dhex jira: **2** Ilaaliya idaha Ilaah oo idin dhex jooga, idinkoo aan qasab ahaan u dhawrayn, laakiinse raalli ka ah sida Ilaah doonayo. **3** Oo weliba ha u dhawrina faa'iido ceeb ah daraaddeed, laakiinse ku dhawra maan diyaar ah, hana u xukumina sida idinkoo sayidyo u ah kuwaad u talisaan, laakiinse idaha masaallo u noqda. **4** Oo marka Adhijirka sare la muujiyo, idinku waxaad heli doontaan taajka ammaanta oo aan baabba'ayn. **5** Sidaasoo kalena dhallinyaraday, odayaasha ka dambeeya, oo kulligiinba is-hoosaysiiya, in midkiinba midka kale u adeego, maxaa yeelay, Ilaah waa hor joogsadaa kuwa kibra, laakiinse kuwa is-hoosaysiiya ayuu nimco siiyaa. **6** Haddaba sidaas daraaddeed gacanta xoogga leh oo Ilaah iska hoosaysiiya, si uu wakhtigiisa idiin sarraysiiyo. **7** Welwelkiinna oo dhan isaga saara, maxaa yeelay, isagu dan buu idinka leeyahay. **8** Feeyignaada oo soo jeeda, waayo, cadowgiinna Ibliiska ahu sida libaax ciyaya ayuu u wareegaa oo u doondoonaa cid uu liqo. **9** Isaga hor joogsada, idinkoo iimaankiinna ku adag, oo garanaya in isla dhibaatooyinkaasu ay ku dhacaan walaalahiinna dunida ku jira. **10** Haddaba Ilaaha leh nimcada oo dhan oo idiinku yeedhay ammaantiisa daa'imkaa oo Masiixa ku jirta, markii aad in yar xanuunsataan ka dib isagu wuu idin kaamili doonaa, oo idin adkayn doonaa, oo idin xoogayn doonaa. **(aiōnios g166)** **11** Weligiis iyo weligiisba xoogga isagaa leh. Aamiin. **(aiōn g165)** **12** Waxaan warqad yar idiinku soo qoray gacanta walaalkeen Silwanos oo aan ku tirinayo inuu aamin yahay. Oo waxaan idinku waaninayaa oo marag ahaan idiinku sheegayaa in tanu tahay nimcada Ilaah oo run ah. Taas ku adkaada **13** Waxaa idin soo salaamaya tan Baabuloon joogta oo laydinla doortay, iyo wiilkayga Markos. **14** Isku salaama dhunkasho jacayl ah. Oo intiinna Masiixa kuwiisa ah oo dhan nabaddu ha u ahaato.

# 2 Butros

1 Anigoo ah Simoon Butros, oo addoon iyo rasuulba u
ah Ciise Masiix, waxaan warqaddan u qorayaa kuwa
helay iimaan qaali ah oo keenna la mid ah, oo ku helay
xaqnimada Ilaaheenna iyo Badbaadiyeheenna Ciise Masiix.
2 Nimco iyo nabadu ha idinku bateen xagga aqoonta Ilaah iyo
Rabbigeenna Ciise. 3 Maxaa yeelay, Ilaah xooggiisu wuxuu
ina siiyey wax kasta oo ku saabsan nolosha iyo cibaadadaba,
oo wuxuu inagu siiyey aqoonta kan inoogu yeedhay
ammaantiisa iyo wanaaggiisa. 4 Wuxuu kuwaas inagu siiyey
ballamadiisa qaaliga ah oo aad iyo aad u waaweyn, inaad
kuwaas ku noqotaan kuwo ka qayb qaata dabiicadda Ilaah,
idinkoo ka baxsaday kharribaadda dunida ku jirta ee ku
timid damaca jidhka. 5 Sababtaas daraaddeed idinkuna
aad u dadaala, oo rumaysadkiinna waxaad ku dartaan
wanaag, wanaaggiinnana aqoon, 6 aqoontiinnana iscelin,
iscelintiinnana dulqaadasho, dulqaadashadiinnana cibaado,
7 cibaadadiinnana kalgacayl walaalnimo, kalgacaylkiinna
walaalnimona jacayl. 8 Haddii aad waxyaalahaas leedihiin
oo ay idinku badan yihiin, iyagu waxay idinka dhigayaan
kuwo aan cajisiin ama midhalaawayaal ahayn xagga aqoonta
Rabbigeenna Ciise Masiix. 9 Waayo, kii waxyaalahaasu ka
maqan yihiin wuu indha la' yahay oo arag gaaban yahay,
oo wuxuu illoobay in dembiyadiisii hore laga safeeyey. 10
Sidaas daraaddeed, walaalayaalow, aad ugu dadaala inaad
xaqiijisaan in laydiin yeedhay oo laydin doortay, waayo, haddii
aad waxyaalahaas samaysaan, weligiin ma turunturoon
doontaan. 11 Saas daraaddeed aad baa laydiin siin doonaa
gelidda boqortooyada daa'imiska ah oo Rabbigeenna Ciise
Masiix oo Badbaadiyeheenna ah. **(aiōnios g166)** 12 Sidaas
daraaddeed anigu had iyo goorba diyaar baan u ahaan
doonaa inaan waxyaalahan idin xusuusiyo, in kastoo weliba
aad taqaaniin oo laydinku adkeeyey runta aad haysataan.
13 Waxaa ila qumman in in alla intii aan jidhkan ku jiro aan
xusuusin idinku guubaabiyo. 14 Waayo, waan ogahay inay
dhaqso u imanayso goortii aan jidhkan ka tegi lahaa siduu
Rabbigeenna Ciise Masiix i ogeysiiyey. 15 Waxaan ku dadaali
doonaa inaad tegiddayda dabadeed mar kastaba awooddaan
inaad waxyaalahan xusuusataan. 16 Annagu ma aannu
raacin sheekooyin khiyaano lagu hindisay, markii aannu idin
ogeysiinnay xoogga iyo imaatinka Rabbigeenna Ciise Masiix,
laakiinse waxaannu ahayn markhaatiyaal indhaha ku arkay
weynaantiisa. 17 Waayo, isagu wuxuu xagga Ilaaha Aabbaha
ah ka helay maamuus iyo ammaan markii cod sidaas ahu
isaga uga yimid xagga ammaanta aad u weyn ee yidhi,
Kanu waa Wiilkayga aan jeclahay oo aan ku faraxsanahay.
18 Oo codkaas aannu maqalnay wuxuu ka yimid samada
markii aannu buurta quduuska ah isaga la joognay. 19 Oo
waxaynu haysannaa hadalka nebiyadii sii sheegeen, oo
aad loo sii xaqiijiyey, oo waad ku wanaagsan tihiin inaad u
fiirsataan hadalkaas sida laambad meel gudcur ah ka ifaysa,
ilaa waagu beryayo oo xiddigta waaberi qalbigiinna ka soo
baxdo, 20 idinkoo taas horta garanaya in wixii nebiyadii
sii sheegeen oo la qoray ayan lahayn micnayn gooni ah.
21 Waayo, wixii nebiyadii sii sheegeen weligood kuma ay
iman dadka doonistiisa, laakiinse dad Ruuxa Quduuska ahu
waday ayaa xagga Ilaah kaga hadlay.

2 Laakiinse waxaa dadkii ka dhex kacay nebiyo been
ah, oo idinkana sidaas oo kale waxaa idinku dhex jiri
doona macallimiin been ah, oo qarsoodi idinku keeni doona
bidcinimo wax halligaysa, iyagoo diidaya xataa Sayidkii soo
iibsaday, oo dushooda ku soo dejinaya halligaad dhaqso
ah. 2 Kuwa badan baa raaci doona ficiladooda nijaasta
ah, oo sababtooda ayaa loo caayi doonaa jidka runta ah.
3 Damac xumaan bay hadallo iskayeelyeel ah idinkaga
baayacmushtari doonaan, kuwaas oo xukunkoodii waa hore
lagu xukumay uusan haatan raagayn, halligaaddoodiina
ayan gam'ayn. 4 Maxaa yeelay, Ilaah uma tudhin malaa'igihii
dembaabay, laakiinse wuxuu iyagii ku tuuray cadaabta, oo
wuxuu ku riday godad gudcur ah iyagoo xukun aawadiis
loo hayo. **(Tartaroō g5020)** 5 Oo dunidii horena uma u
tudhin, laakiinse wuxuu badbaadshay Nuux, oo ahaa mid
xaqnimada wax ku wacdiya, iyo toddoba qof oo kale,
markuu daadkii ku soo daayay dunidii cibaadalaawayaasha.
6 Oo magaalooyinkii ahaa Sodom iyo Gomorana wuxuu
ka dhigay dambas, oo intuu afgembi ku xukumay, ayuu
masaal uga dhigay kuwii cibaadalaawayaal noqon lahaa, 7
oo wuxuu ka samatabbixiyey Luud kii xaqa ahaa oo aad
loogu saxariiriyey sharcilaawayaashii dabiicaddoodii nijaasta
ahayd. 8 Waayo, ninkaas xaqa ahaa iyaguu dhex degganaa,
oo waxaa naftiisii xaqa ahayd maalin ka maalin silciyey
camaladoodii sharciga ka geesta ahaa markuu arkay oo
maqlay. 9 Rabbigu waa yaqaan sida kuwa cibaadada leh
jirrabaadda looga samatabbixiyo iyo sida kuwa aan xaqa
ahayn loo hayo iyagoo ciqaaban ilaa maalinta xisaabta, 10
khusuusan kuwa jidhka raaca, iyagoo damaca nijaasta ah
ku socda, oo sayidnimada quudhsada. Iyagu waa indha
adag yihiin oo waa macangag, kamana cabsadaan inay
kuwa derejada leh caayaan. 11 Malaa'iguhuna in kastoo ay
iyaga itaal iyo xoogba ka badan yihiin, iyaga dacwo cay ah
Rabbiga hortiisa kagama dacweeyaan. 12 Laakiinse kuwanu
waa sida xayawaan aan caqli lahayn oo u dhashay in la

qabsado oo la dilo, oo waxay caayaan wax aanay garanayn.
Hubaal iyagu halligaaddooda ayay ku halligmi doonaan.
13 Xaqdarradooda waxaa loogu abaalgudaa xaqdarro, oo
waxaa iyaga la wanaagsan inay maalinnimada raaxaystaan.
Iyagu waa waskhaamiin iyo ceebaalowyo, oo markay idinla
feeysteeyaan waxay ku raaxaystaan khiyaanadooda. 14
Waxay leeyihiin indho sino miidhan ah oo aan dembi ka
joogsan karin. Kuwa aan adkayn ayay sasabtaan, waxayna
leeyihiin qalbi damacxumaan ku noqnoqda, oo waa dad
nacladeed. 15 Jidkii qummanaa ayay ka leexdeen oo way
ambadeen, waxayna raaceen jidkii Balcaam ina Becoor oo
jeclaaday abaalgudka xaqdarrada. 16 Laakiinse isaga waxaa
loo canaantay xadgudubkiisii aawadiis. Dameer carrab la'
ayaa ku hadlay dad codkiis, oo wuxuu joojiyey waallidii
nebiga. 17 Kuwanu waa ilo aan biyo lahayn, iyo ceeryaamo
uu duufaan kaxeeyo, oo waxaa iyaga daraaddood loo sii
dhigay madowga gudcurka. 18 Waayo, iyagu waxay ku
hadlaan hadal faan ah oo aan micne lahayn, oo kuwa in yar
kaga baxsanaya kuwa qaladka ku socda ayay ku sasabtaan
damacyada jidhka xagga nijaasta; 19 oo waxay iyaga ugu
ballanqaadaan xorriyad, laakiinse iyaga qudhooduba waa
addoommadii kharribaadda. Waayo, wixii ka adkaada nin
ayaa isaga addoonsada. 20 Waayo, markii ay nijaasta dunida
kaga baxsadeen aqoontii Rabbiga ah Badbaadiyeheenna
Ciise Masiix, haddii ay haddana ku dhex murgaan oo laga
adkaado, xaalkooda dambe waa ka sii xumaadaa kii hore.
21 Intii ay jidka xaqnimada aqoon lahaayeen oo ay dib uga
noqon lahaayeen amarka quduuska ah oo iyaga la siiyey,
waxaa uga wanaagsanaan lahayd inayan aqoon jidkaas.
22 Wixii maahmaahda runta ah lagu yidhi ayaa iyaga ku
dhacay. Eeygu wuxuu ku noqdaa mantaggiisa. Doofaarraddii
maydhatayna waxay dib ugu noqotaa gelgelinta dhoobada.

3 Gacaliyayaalow, tanu waa warqaddii labaad oo aan idiin
soo qoray, oo labadoodaba waxaan maankiinna daacadda
ah ku guubaabinayaa xusuusin, 2 inaad xusuusataan erayadii
ay nebiyadii quduuska ahaa hore ugu hadleen, iyo amarkii
Rabbiga Badbaadiyaha ah oo ay rasuulladiinnu ku hadleen.
3 Marka hore waxaad og tihiin in maalmaha ugu dambeeya
kuwa majaajiloodaa ay la iman doonaan majaajilo iyagoo
damacyadooda daba socda, 4 oo waxay odhan doonaan,
Ballankii imaatinkiisii meeh? Waayo, haatan iyo maalintii
awowayaashii ay dhinteen wax waluba waxay u socdaan
sidii ay ahaayeen tan iyo bilowgii abuurniinta. 5 Waayo, iyagu
kaas bay u illoobaan in waagii hore samooyin jireen iyo dhul
erayga Ilaah biyo lagaga dhex abuuray, 6 kuwaas oo dunidii
waagaas jirtay ay ku baabba'day iyadoo daad qaaday. 7
Laakiinse samooyinka haatan jira iyo dhulkaba isku eray baa
dab loogu kaydiyey, oo waxaa loo hayaa maalinta xisaabta
iyo halligaadda dadka cibaadalaawayaasha ah. 8 Laakiinse,
gacaliyayaalow, waxan keliya ha illoobina in maalin keliyahu
Rabbiga la tahay sida kun sannadood, kun sannadoodna
la yihiin sida maalin keliya. 9 Rabbigu kama raago inuu
ballankiisa oofiyo sida dadka qaarkiis ku tiriyo inay tahay
raagid, laakiinse idinkuu idiin dulqaadanayaa, oo dooni
maayo in qofnaba halligmo, laakiinse wuxuu doonayaa in
kulli la wada toobadkeeno. 10 Laakiinse maalinta Rabbigu
waxay u iman doontaa sida tuug oo kale; maalintaas oo ay
samooyinku baabbi'i doonaan iyagoo sanqadh weynu ka
yeedhayso, oo waxyaalaha abuuranna iyagoo gubanaya
ayay baabbi'i doonaan. Dhulka iyo shuqullada ku jirana waa
la gubi doonaa. 11 Haddii waxyaalahan oo dhammu ay
sidaas u baabbi'i doonaan, haddaba dad caynkee ah baa
idinku waajib ah inaad noqotaan si aad ugu dhaqantaan
dabiicad quduus ah iyo cibaado, 12 idinkoo sugaya oo aad
ugu dadaalaya imaatinka maalinta Ilaah, taasoo samooyinku
iyagoo ololaya ay baabbi'i doonaan, waxyaalaha abuuranna
iyagoo gubanaya ayay dhalaali doonaan. 13 Laakiinse sidii
uu inoo ballanqaaday, waxaynu sugaynaa samooyin cusub
iyo dhul cusub oo xaqnimo dhex deggan tahay. 14 Sidaas
daraaddeed, gacaliyayaalow, idinkoo waxyaalahaas sugaya,
ku dadaala in laydin helo idinkoo nabdoon oo aan wasakh
iyo eed lahayn Ilaah hortiisa. 15 Sidii walaalkeen gacaliye
Bawlos idiinku soo qoray xigmaddii la siiyey, ku tiriya in
dulqaadashada Rabbigeennu tahay badbaado; 16 siduu
warqadihiisii oo dhan waxyaalahan ugaga hadlay. Kuwaas
waxaa ku jira wax in la gartaa ay dhib tahay, oo jaahiliinta
iyo kuwaan adkayn ayaa qalloociya, siday Qorniinka kaleba
u qalloociyaan oo ay u halligmaan. 17 Sidaas daraaddeed,
gacaliyayaalow, idinkoo waxyaalahan hore u garanayay,
isjira, yaan laydinku kaxaysan qaladka kuwa sharka ah
oo aydnaan ka dhicin adkaantiinna. 18 Laakiinse ku kora
nimcada iyo aqoonta Rabbigeenna ah Badbaadiyeheenna
Ciise Masiix. Isaga ammaanu ha u ahaato haatan iyo
weligeedba. Aamiin. (aiōn g165)

# 1 Yooxanaa

1 Waxaannu idiin soo qoraynaa wax ku saabsan wixii tan iyo
bilowgii jiray, oo aannu maqalnay, oo aannu indhahayaga
ku aragnay, oo aannu eegnay, oo ay gacmahayagu taabteen
oo Ereyga nolosha ah. 2 Nolosha waa la muujiyey, oo
waannu aragnay, waanan u marag furaynaa, oo waxaannu
idiinka warramaynaa nolosha weligeed ah, ta Aabbaha
la jirtay oo lanoo muujiyey. (aiōnios g166) 3 Wixii aannu
aragnay oo aannu maqalnay ayaannu idiinka warramaynaa,
si aad idinkuna noo soo wehelisaan; oo wehelnimadeennu
waa mid la jirta Aabbaha iyo Wiilkiisa Ciise Masiix ah. 4
Oo waxaannu waxyaalahan idiinku soo qoraynaa si ay
farxaddiinnu u buuxsanto. 5 Warkii aannu ka maqalnay
oo aan idiinka warramayno wuxuu yahay, in Ilaah nuur
yahay, oo isaga aan gudcur ku jirin innaba. 6 Haddaynu
nidhaahno, Wehelnimo ayaynu la wadaagnaa isaga, oo aynu
gudcurka ku soconno, been baynu sheegnaa, oo runta ma
falno. 7 Laakiin haddaynu nuurka ku soconno siduu isaguba
nuurka ugu jiro, wehelnimo ayaynu isla wada wadaagnaa,
oo dhiigga Ciise, oo Wiilkiisa ah, wuxuu inaga nadiifiyaa
dembi oo dhan. 8 Haddaynu nidhaahno, Dembi ma lihin,
nafsaddeenna ayaynu khiyaanaynaa, oo runtuna inaguma
jirto. 9 Haddaynu dembiyadeenna qiranno, isagu waa aamin
iyo caaddil inuu dembiyadeenna inaga cafiyo, oo uu inaga
nadiifiyo xaqdarrada oo dhan. 10 Haddaynu nidhaahno, Ma
aynu dembaabin, waxaynu Ilaah ka dhignaa beenaaleh, oo
ereygiisa inaguma jiro.

2 Carruurtaydiiyey, waxaan waxyaalahan idiinku soo
qorayaa si aydnaan u dembaabin; oo qof uun hadduu
dembaabo, waxaynu xagga Aabbaha ku leennahay
Dhexdhexaadiye, waana Ciise Masiix kan xaqa ah. 2 Oo
isaguna wuxuu dembiyadeenna u yahay kafaaraggudka;
oo kuweenna oo keliya uma aha ee weliba wuxuu u yahay
dembiyada dunida oo dhan. 3 Oo taas ayaynu ku garanaynaa
inaynu naqaan isaga, haddaynu qaynuunnadiisa adkayno. 4
Kan yidhaahda, Waan aqaan isaga, oo aan qaynuunnadiisa
adkayn, waa beenaaleh, oo runtu kuma jirto isaga. 5 Laakiin
kan ereygiisa adkeeya, runtii, Ilaah jacaylkiisu wuu ku dhan
yahay isaga. Taas aynu ku garanaynaa inaynu isaga ku jirno.
6 Kan yidhaahda, Isagaan ku jiraa, waa inuu u socdaa siduu
isagu u socday. 7 Gacaliyayaalow, qaynuun cusub idiin soo
qori maayo, laakiin waxaan idiin soo qorayaa qaynuun hore
oo aad tan iyo bilowgii haysateen. Qaynuunkii hore waa
hadalkii aad bilowgii maqasheen. 8 Oo weliba qaynuun cusub
ayaan idiin soo qorayaa, kaas oo isaga iyo idinkaba run idinku
dhex ah, maxaa yeelay, gudcurku waa dhammaanayaa, oo
nuurka runta ahuna imminkuu iftiimayaa. 9 Kan yidhaahda,
Nuurkaan ku jiraa, oo walaalkiis neceb, wuxuu ku jiraa
gudcurka ilaa imminkada. 10 Kan walaalkii jecel, nuurkuu ku
jiraa, oo wax lagu xumaado kuma jiro isaga. 11 Laakiin kan
walaalkii neceb, gudcurkuu ku jiraa, oo gudcurkuu ku socdaa,
oo garan maayo meeshuu marayo, waayo, gudcurkaa
indhihiisa tiray. 12 Wax baan idiin soo qorayaa, carruurtiiyey,
maxaa yeelay, dembiyadiinnii waa laydinka cafiyey magiciisa
aawadiis. 13 Aabbayaashow, wax baan idiin soo qorayaa,
maxaa yeelay, waad garanaysaan kan tan iyo bilowgii jira.
Ragga dhallinyarada ahow, wax baan idiin soo qorayaa,
maxaa yeelay, idinku kan sharka ah ayaad ka adkaateen.
Carruurtaydiiyey, wax baan idiin soo qoray, maxaa yeelay,
Aabbaha waad garanaysaan. 14 Aabbayaashow, wax baan
idiin soo qoray, maxaa yeelay, waad garanaysaan kan
tan iyo bilowgii jira. Ragga dhallinyarada ahow, wax baan
idiin soo qoray, maxaa yeelay, waad xoog weyn tihiin, oo
ereyga Ilaah baa idinku jira, oo kan sharka ah ayaad ka
adkaateen. 15 Dunida iyo waxyaalaha dunida ku jira toona
ha jeclaanina. Qof uun hadduu dunida jeclaado, jacaylka
Aabbuhu kuma jiro isaga. 16 Maxaa yeelay, waxaa dunida
ku jira oo dhan oo ah damaca jidhka, iyo damaca indhaha,
iyo faanka nolosha, xagga Aabbaha kama yimaadaan ee
waxay ka yimaadaan xagga dunida. 17 Oo duniduna way
idlaanaysaa, iyo damaceeduba; laakiin kan doonista Ilaah
yeelaa wuu jirayaa weligiis. (aiōn g165) 18 Carruurtiiyey, waa
saacaddii u dambaysay, oo sidaad maqasheen inuu kan
Masiixa ka geesta ahi imanayo, weliba imminka kuwa badan
oo Masiixa ka gees ah ayaa kacay, taa aawadeed ayaynu ku
garanaynaa inay saacaddii u dambaysay tahay. 19 Way inaga
baxeen, laakiin kuweennii ma ay ahayn; hadday kuweennii
ahaayeen, way inala joogi lahaayeen; laakiin way inaga
baxeen oo taasaa caddaynaysa inaanay kulligood inaga mid
ahayn. 20 Laakiin idinku waxaad leedihiin subkid ka timid
Kan Quduuska ah, oo wax walba waad taqaaniin. 21 Wixii
aan idiin soo qoray uma aan soo qorin aqoonla'aantiinna
xagga runta aawadeed, laakiin waxaan u soo qoray aqoonta
aad runta taqaaniin iyo inaanay beenina runta ka iman
aawadood. 22 Waa kuma beenaaluhu, kan dafira inuu Ciise
yahay Masiixa mooyaane? Isagu waa kan Masiixa ka geesta
ah, waana kan dafira Aabbaha iyo Wiilkaba. 23 Ku alla kii
Wiilka inkiraa, ma leh Aabbaha; laakiin kan Wiilka qirtaa
Aabbuhuu leeyahay. 24 Haddaba idinku waxaad tan iyo
bilowgii maqlayseen ha idinku sii jiro. Haddii wixii aad tan iyo
bilowgii maqlayseen idinku sii jiro, idinkuna waxaad ku sii jiri
doontaan Wiilka iyo Aabbaha. 25 Oo kanu waa ballankii uu

inoogu ballanqaaday oo ah nolosha weligeed ah. **(aiōnios g166)**
**26** Waxaan idiin soo qoray waxyaalahan ku saabsan kuwa
idin khiyaanaynaya. **27** Subkidda aad ka hesheen isaga way
idinku sii jirtaa; oo uma baahnidin in cidina wax idin barto;
laakiin sida subkiddiisu wax walba idiin barto, oo ay run u
tahay, beenna aanay u ahayn, waa inaad siday wax idiin
bartay ugu sii jirtaan. **28** Oo imminka, carruurtiiyey, ku sii jira
isaga; in kolkuu muuqdo aynu kalsoonaan doonno oo aynaan
wakhtiga imaatinkiisa ka xishoonin inaynu hor tagno. **29**
Haddaad og tihiin inuu xaq yahay, waxaad weliba ogaataan
in mid walba oo xaqnimo falaa uu isaga ka dhashay.

**3** Bal ogaada siduu yahay jacaylka Aabbuhu ina siiyey,
taasoo ah in laynoogu yeedho carruurta Ilaah, oo
saasaynu nahay. Sidaa aawadeed dunidu ina garan mayso,
maxaa yeelay, isagaba ma ay garanaynin. **2** Gacaliyayaalow,
imminka waxaynu nahay carruurta Ilaah; oo weli waxaynu
noqon doonno lama muujin, laakiin waxaynu og nahay
in goortuu muuqdo aynu noqon doonno sidiisa oo kale,
waayo, waynu arki doonnaa isaga siduu yahay. **3** Oo
mid kasta oo waxyaalahaas ka rajeeyaa isaga, naftiisuu
daahiriyaa siduu isaguba daahir u yahay. **4** Kii kasta oo
dembi falaa wuxuu falaa caasinimo; oo dembigu wuxuu
yahay caasinimo. **5** Oo idinku waad og tihiin in isagu u
muuqday inuu dembiyadeenna inaga qaado, oo isagu dembi
ma leh. **6** Ku alla kii isaga ku sii jiraa, ma dembaabo; ku alla
kii dembaabaa ma uu arkin isaga, oo weliba ma yaqaan
isaga. **7** Carruurtiiyey, yaan cidi idin khiyaanayn; kii xaqnimo
falaa waa xaq siduu isaguba xaq u yahay. **8** Kii dembi falaa
wuxuu yahay kan Ibliiska; oo Ibliisku tan iyo bilowgii ayuu
dembaabayay. Taas aawadeed ayuu Wiilka Ilaah u muuqday
inuu baabbi'iyo shuqullada Ibliiska. **9** Ku alla kii Ilaah ka
dhashay dembi ma falo; maxaa yeelay, Ilaah dabiicaddiisu
way ku sii jirtaa isaga; oo ma dembaabi karo, waayo, wuxuu
ka dhashay Ilaah. **10** Tan ayay carruurta Ilaah iyo carruurta
Ibliisku ku kala muuqdaan; ku alla kii aan xaqnimo falin ma
aha kan Ilaah, oo waxaa la mid ah kan aan walaalkii jeclayn.
**11** Oo kanu waa warkii aad tan iyo bilowgii maqlayseen,
kaasoo ah inaynu isjeclaanno, **12** oo aynaan ahaanin sida
Qaabiil oo ahaa kan sharka leh oo walaalkii dilay. Oo muxuu
u dilay? Waayo, shuqulladiisu waxay ahaayeen shar, oo
kuwii walaalkiisna xaq bay ahaayeen. **13** Walaalayaalow, ha
la yaabina haddii ay dunidu idin neceb tahay. **14** Waxaynu
og nahay inaynu dhimashada ka soo gudubnay oo aynu u
soo gudubnay nolosha, maxaa yeelay, walaalaha ayaynu
jecel nahay. Oo ka aan walaalkii jeclayn, dhimashaduu ku
sii hadhaa. **15** Ku alla kii walaalkii neceb waa dhiigqabe,
oo idinkuna waad og tihiin inaanu dhiigqabena lahayn
nolosha weligeed ah oo ku sii jiraysa. **(aiōnios g166)** **16**
Taasaynu jacaylka ku garanaynaa, waayo, isagu naftiisuu u
bixiyey aawadeen; oo innaguna waa inaynu nafteenna u
bixinno walaalaheen. **17** Laakiin kan leh xoolaha dunidan,
oo arka walaalkiis oo baahan, oo qalbigiisa ka xidha, sidee
baa jacaylka Ilaah ugu jiraa isaga? **18** Carruurtaydiiyey,
yeynan ku jeclaanin hadalka iyo afka toona, laakiin camalka
iyo runta aan ku jeclaanno. **19** Oo taasaynu ku garan
doonnaa inaynu kuwa runta nahay, oo aynu isaga hortiisa
qalbigeenna kaga dhiiro gelin doonnaa **20** xagga wax alla
wixii qalbigeennu inagu eedeeyo, maxaa yeelay, Ilaah waa
ka weyn yahay qalbigeenna, oo wax walbaba wuu og yahay.
**21** Gacaliyayaalow, haddii aan qalbigeennu ina eedayn,
kalsoonaan ayaynu ku leennahay xagga Ilaah. **22** Oo wax
kastoo aynu ka barinno waynu ka helnaa, maxaa yeelay,
qaynuunnadiisa ayaynu xajinnaa, oo waxaynu falnaa waxa
isaga ka farxiya. **23** Oo kanu waa qaynuunkiisa, kaasoo ah
inaynu rumaysanno magaca Wiilkiisa Ciise Masiix ah, oo
aynu isjeclaanno, siduu qaynuunka inoo siiyey. **24** Oo kii
xajiya qaynuunnadiisa, wuu ku sii jiraa isaga, isaguna wuu
ku sii jiraa. Oo saasaynu ku garanaynaa inuu isagu inagu sii
jiro xagga Ruuxa uu ina siiyey.

**4** Gacaliyayaalow, ha rumaysanina ruux walba, laakiin
ruuxyada tijaabiya si aad u hubsataan inay kuwa Ilaah
yihiin; waayo, nebiyo badan oo been ah ayaa u soo baxay
dunida. **2** Taasaad ku garanaysaan Ruuxa Ilaah; ruux walba
oo qirta in Ciise Masiix jidh ku yimid, waa ku Ilaah. **3** Oo ruux
walba oo aan qiran Ciise Masiix ku Ilaah ma aha; oo kanuna
waa ruuxa kan Masiixa ka geesta ah oo aad maqasheen
inuu imanayo, imminkana duniduu ku jiraa. **4** Carruurtiiyey,
kuwa Ilaah baad tihiin, oo iyagaad ka adkaateen; maxaa
yeelay, Ka idinku jira ayaa ka weyn ka dunida ku jira. **5** Iyagu
waa kuwa dunida; oo taas aawadeed waxay ka hadlaan
waxa dunida, oo duniduna way maqashaa. **6** Innaguna
kuwa Ilaah baynu nahay; ka Ilaah yaqaan waa ina maqlaa;
oo ka aan kan Ilaah ahaynna inama maqlo. Taasaynu
ku garanaynaa ruuxa runta ah iyo ruuxa qaladka ah. **7**
Gacaliyayaalow, aynu isjeclaanno; waayo, Ilaah baa leh
jacaylka; oo mid walba oo jecel, wuxuu ka dhashay Ilaah,
Ilaah buuna yaqaan. **8** Oo ka aan jeclaynina Ilaah ma
yaqaan; waayo, Ilaah waa jacayl. **9** Ilaah baa Wiilkiisa keliya
oo dhashay dunida u soo diray si aynu ugu noolaanno isaga,
oo taasaa jacaylka Ilaah laynoogu muujiyey. **10** Oo taas
jacayl baa ku jira, mana aha inaynu Ilaah jeclayn, laakiinse
isagaa ina jeclaaday, oo wuxuu Wiilkiisa u soo diray si uu
kafaaraggudka dembiyadeenna u noqdo. **11** Gacaliyayaalow,

haddii Ilaah sidaa inoo jeclaaday, waa inaynu isjeclaanno.
12 Cidina Ilaah ma arkin marnaba. Haddii aynu isjeclaanno,
Ilaah wuu inagu jiraa, oo jacaylkiisu wuu inagu dhan yahay.
13 Ruuxiisuu ina siiyey oo taasaynu ku garanaynaa inaynu
ku sii jirno isaga, isaguna inagu sii jiro. 14 Innagu waynu
aragnay oo waxaynu markhaati u furaynaa in Aabbuhu
Wiilka soo diray si uu Badbaadiyaha dunida u noqdo. 15 Ku
alla kii qirta inuu Ciise yahay Wiilka Ilaah, Ilaah baa ku sii jira
isaga, isaguna wuu ku sii jiraa Ilaah. 16 Oo innaguna waan
garanaynaa oo waan rumaysan nahay jacaylka Ilaah inoo
qabo. Ilaah waa jacayl; oo kii ku sii jiraa jacaylka, Ilaah buu
ku sii jiraa, Ilaahna isaguu ku sii jiraa. 17 Taasaa jacaylku
kaamil inoogu noqday si aynu kalsoonaan u lahaanno
maalinta xisaabta; maxaa yeelay, siduu isagu yahay ayaynu
innaguna dunidan ku nahay. 18 Jacaylku baqdin ma leh,
laakiin jacaylka kaamilka ahi baqdinta dibadduu u saaraa,
waayo, baqdintu ciqaab bay leedahay. Oo kii baqaana
kaamil kuma noqdo jacaylka. 19 Waynu jecel nahay isaga,
waayo, isagaa hore inoo jeclaaday. 20 Haddii qof yidhaahdo,
Ilaah waan jeclahay, oo uu walaalkiis neceb yahay, waa
beenaaleh, maxaa yeelay, kan aan jeclayn walaalkii uu
arko sidee buu u jeclaan karaa Ilaaha uusan arag? 21 Oo
waxaynu isaga ka haysannaa qaynuunkan, kaas oo ah, Kii
Ilaah jecel, walaalkiina ha jeclaado.

**5** Ku alla kii rumaysta inuu Ciise yahay Masiixa, Ilaah buu
ka dhashay; oo ku alla kii jecel kan dhalay, kan isaga ka
dhashayna wuu jecel yahay. 2 Taasaynu ku garanaynaa
inaynu carruurta Ilaah jecel nahay, goortaynu Ilaah jeclaanno
oo qaynuunnadiisa xajinno. 3 Waa kan jacaylka Ilaah, kaasoo
ah inaynu qaynuunnadiisa xajinno; oo qaynuunnadiisuna
ma cusla. 4 Ku alla kii ka dhashay Ilaah, wuxuu ka
adkaadaa dunida, oo waxaa libta ka adkaata dunida ah
rumaysadkeenna. 5 Waa ayo kan dunida ka adkaadaa, kan
rumaystaa inuu Ciise yahay Wiilka Ilaah mooyaane? 6 Kanu
waa kii biyo iyo dhiig ku yimid, oo ah Ciise Masiix; biyo keliya
kuma iman, laakiin wuxuu ku yimid biyo iyo dhiig. 7 Oo waa
Ruuxa kan maragga furaa, waayo, Ruuxa waa runta. 8
Waxaa jira saddex marag fura; waana Ruuxa iyo biyaha iyo
dhiigga, oo saddexdaasuna waa isku mid. 9 Haddii aynu
maragfurka dadka aqbali lahayn, maragfurka Ilaah baa ka
weyn, waayo, maragfurka Ilaah waa kan oo ah inuu Wiilkiisa
ka marag furay. 10 Ka Wiilka Ilaah rumaystaa maragguu ku
haystaa nafsaddiisa, kii aan Ilaah rumaysanna, wuxuu isaga
ka dhigay beenaaleh; maxaa yeelay, wuxuusan rumaysan
maraggii uu Ilaah ka marag furay Wiilkiisa. 11 Maragguna
waa kan, kaas oo ah in Ilaah ina siiyey nolosha weligeed ah,
oo ay noloshanu Wiilkiisa ku jirto. **(aiōnios g166)** 12 Kan Wiilka
haystaa, noloshuu leeyahay. Kii aan Wiilka Ilaah haysanna
nolosha ma leh. 13 Waxyaalahan waxaan idiinku soo qoray,
idinka oo rumaystay magaca Wiilka Ilaah, si aad u ogaataan
inaad nolosha weligeed ah leedihiin. **(aiōnios g166)** 14 Oo tanu
waa kalsoonaanta aynu isaga u qabno, taasoo ah haddaynu
wax uun doonistiisa ku barinno, isagu wuu ina maqlaa, 15 oo
haddaynu og nahay inuu inaga maqlo wax alla wixii aynu ka
barinno, waxaynu og nahay inaynu leennahay waxyaalihii
aynu isaga ka barinnay. 16 Haddii qof uun arko walaalkii oo
samaynaya dembi aan xagga dhimashada ahayn, waa inuu
Ilaah baryo; isaguna noloshuu siin doonaa kuwa samaynaya
dembi aan xagga dhimashada ahayn. Waxaa jira dembi
xagga dhimashada ah. Oo anigu odhan maayo, Kaas ha ka
tukado. 17 Xaqdarrada oo dhammu waa dembi; oo waxaa
jira dembi aan xagga dhimashada ahayn. 18 Waan og nahay
in ku alla kii Ilaah ka dhashay aanu dembaabin. Maxaa
yeelay, kii ka dhashay Ilaah naftiisuu ilaaliyaa, oo ka sharka
lihina ma taabto. 19 Waxaynu og nahay inaynu kuwa Ilaah
nahay, oo ay dunida oo dhammuna ku jirto gacanta ka
sharka leh. 20 Waxaynu og nahay in Wiilka Ilaah yimid, oo
wuxuu ina siiyey garasho si aynu ugu garanno kan runta ah;
innaguna waa ku jirnaa kan runta ah, oo ah Wiilkiisa ee Ciise
Masiix ah. Kanu waa Ilaaha runta ah iyo nolosha weligeed
ah. **(aiōnios g166)** 21 Carruurtiiyey, sanamyada iska ilaaliya.

# 2 Yooxanaa

1 Anigoo odayga ah waxaan salaamayaa marwada la
doortay iyo carruurteeda aan runta ku jeclahay, keligayna
ma ahaye, laakiin xataa waxaa jecel kuwa runta yaqaan oo
dhan, 2 runta inagu dhex jirta, weligeedna inagu dhex jiri
doonta aawadeed. (aiōn g165) 3 Nimco iyo naxariis iyo nabad
ka yimaada Ilaaha Aabbaha ah iyo Ciise Masiix oo ah Wiilka
Aabbaha ayaa inala jiri doona xagga runta iyo jacaylka. 4
Aad baan ugu farxay markaan arkay carruurtaadii qaarkood
oo runta ku socda, waana sidaynu Aabbaha amar uga
helnay. 5 Oo haatan waxaan kaa baryayaa, murwoy, sidii
anigoo aan kuu soo qorayn amar cusub laakiinse kii aynu
tan iyo bilowgii haysannay, kaasoo ah inaynu isjeclaanno. 6
Tanu waa jacayl inaynu amarradiisa ku soconno. Amarkiina
waa kan, waana sidaad tan iyo bilowgii u maqli jirteen inaad
ku socotaan. 7 Waayo, khaa'inno badan baa dunida u soo
baxay, waana kuwa aan qiran in Ciise Masiix jidh ku yimid.
Kaasu waa khaa'inka iyo ku Masiixa ka gees ah. 8 Iska jira
si aydnaan u khasaarayn wixii aynu falnay, laakiinse si aad
abaalgud dhan u heshaan. 9 Mid kasta oo dhaafa oo aan
cilmiga Masiixa ku sii socon, kaasu Ilaah ma leh; laakiin kii
cilmiga ku sii socdaa, Aabbaha iyo Wiilka labadaba wuu
leeyahay. 10 Haddii nin idiin yimaado oo uusan cilmigan
idiin keenin, gurigiinna ha soo gelinina, hana salaamina, 11
waayo, kii salaamaa, wuxuu ka qayb galaa shuqulladiisa
sharka ah. 12 In kastoo aan hayo wax badan oo aan idiin
soo qoro, ma aan jeclayn inaan warqad iyo khad idiinku soo
qoro; laakiinse waxaan rajaynayaa inaan idiin imaado oo aan
afkayga idinkula hadlo, si ay farxaddiinnu u buuxsanto. 13
Carruurtii walaashaada la doortay way ku soo salaamayaan.

# 3 Yooxanaa

1 Anigoo odayga ah waxaan warqaddan u qorayaa gacaliye
Gayos oo aan runta ku jeclahay. 2 Gacaliyow, waxaan
kuugu duceeyaa inaad wax kasta ku liibaantid oo aad
caafimaad qabtid siday naftaadu u liibaansan tahay. 3
Waayo, aad baan ugu farxay markii walaalo yimaadeen oo ka
markhaati fureen runtaada iyo sidaad runta ugu socotid. 4 Ma
lihi farxad tan iiga weyn inaan maqlo in carruurtaydu ay runta
ku socdaan. 5 Gacaliyow, aaminnimaad ku samaysaa shuqul
kasta oo aad u samaysid walaalaha iyo shisheeyahaba.
6 Iyagu jacaylkaagay kiniisadda horteeda kaga markhaati
fureen. Wanaag baad samayn lahayd haddii aad iyaga u
ambabbixisid sida Ilaah istaahilo; 7 maxaa yeelay, magiciisa
aawadiis ayay u ambabbexeen iyagoo aan waxba ka qaadan
dadka aan Yuhuudda ahayn. 8 Sidaas daraaddeed waxaa
inagu waajib ah inaynu kuwaas oo kale soo dhowayno, si
aynu u noqonno kuwa runta kala wada shaqeeya iyaga. 9
Wax baan kiniisadda u soo qoray, laakiinse Diyotrefees oo
jecel inuu iyaga ka sarreeyo, na aqbali maayo. 10 Sidaas
daraaddeed, haddaan imaado, waxaan xusuusin doonaa
shuqulladiisa uu sameeyo isagoo hadallo xunxun nagu
shubaya. Taasu kuma filla isaga, mana aqbalo walaalaha,
kuwii aqbali lahaana wuu u diidaa, kiniisaddana wuu ka
eryaa. 11 Gacaliyow, ha ku dayan waxa sharka ah, laakiinse
ku dayo waxa wanaagsan. Ka samafalaa waa ku Ilaah,
ka shar falaase Ilaah ma uu arkin. 12 Dadka oo dhammu
way u markhaati furaan Deemeetriyos, runta qudheedu
way u markhaati furtaa, annaguna waannu u markhaati
furnaa, waanad og tahay in markhaatifurkayagu run yahay.
13 Waxaan hayay waxyaalo badan oo aan kuu soo qoro,
laakiinse dooni maayo inaan qalin iyo khad kuugu soo qoro.
14 Laakiin waxaan rajaynayaa inaan dhowaan ku arko, oo
aynu afkeenna iskula hadli doonno. Nabadu ha kula jirto.
Saaxiibbadii way ku soo salaamayaan. Saaxiibbada igu
salaan mid kasta intaad magiciisa ugu yeedhid.

# Yuudas

1 Anigoo Yuudas ah oo ah addoonkii Ciise Masiix,
Yacquubna walaalkiis ah, waxaan warqaddan u qorayaa
kuwa loo yeedhay oo Ilaaha Aabbaha ahu jecel yahay, Ciise
Masiixna loo dhawray. 2 Naxariis iyo nabad iyo jacayl ha idiin
bateen. 3 Gacaliyayaalow, intaan aad u dadaalayay inaan
idiin soo qoro wax ku saabsan badbaadada inaga dhexaysa,
waxaa dirqi igu noqday inaan idiin soo qoro oo aan idinku
waaniyo inaad aad ugu dadaashaan iimaankii mar la wada
siiyey quduusiinta oo dhan. 4 Waayo, waxaa jira niman
qarsoodi idiinku soo galay, waana kuwii waa hore xukunkan
loo qoray, oo ah kuwa aan cibaadada lahayn, oo nimcada
Ilaaheenna ku beddela nijaas, oo inkira Ciise Masiix oo ah
Sayidkeenna iyo Rabbigeenna keliya. 5 Hadda, in kastoo
aad hore u tiqiineen wax kasta, waxaan jeclahay inaan idin
xusuusiyo sidii Rabbigu dad uga badbaadiyey dalka Masar,
dabadeedna u baabbi'iyey kuwii aan rumaysan isaga; 6
oo malaa'igihii aan dhawrin madaxtinimadoodii, laakiinse
rugtoodii ka tegey, wuxuu ilaa xukunka maalinta weyn ku
hayaa silsilado weligood ah iyagoo gudcur ku hoos jira. **(aïdios
g126)** 7 Si la mid ah Sodom iyo Gomora iyo magaalooyinkii
kale ee ku wareegsanaa oo sinaystay oo jidh kale uga daba
orday, ayaa masaal laga dhigay, iyagoo ciqaabta dabka
weligiis ah ku silcaya. **(aiōnios g166)** 8 Weliba kuwan riyooda
sidaas oo kalay jidhkooda u nijaaseeyaan, sayidnimadana
u nacaan, oo kuwa derejada leh u caayaan. 9 Laakiin
Mikaa'iil oo ah malagga sare markuu Ibliiska kula murmayay
meydkii Muuse aawadiis, kuma uu dhicin inuu xukun cay
ah ku xukumo, laakiinse wuxuu ku yidhi, Rabbigu ha ku
canaanto. 10 Laakiin kuwanu wax kastoo ayan garanaynba
way caayaan, oo waxay ku baabba'aan waxay abuuristooda
ku garanayaan sida xayawaanka aan caqliga lahayn. 11
Waa u hoog iyaga, waayo, waxay raaceen jidkii Qaabiil, oo
faa'iido aawadeed ayay Balcaam qaladkiisii ugu yaaceen, oo
waxay ku halligmeen fallaagadii Qorax. 12 Kuwanu waa
dhagaxyo qarsoon oo ku dhex jira cashooyinkiinna jacaylka
markay idinla faysteeyaan iyagoo aan cabsanaynin; waxayna
yihiin adhijirro naftooda jira, iyo daruuro aan biyo lahayn oo
dabaylo kaxeeyaan, iyo geedo jiilaal oo aan midho lahayn,
oo laba goor dhintay, oo la rujiyey; 13 iyo hirar kacsan oo
badda, oo ceebtoodu xumbaynayso, iyo xiddigo ambaday, oo
madowga gudcurka weligood loo hayaa. **(aiōn g165)** 14 Enoog
oo ahaa farcankii toddobaad oo Aadan isna kuwanuu wax
ka sii sheegay isagoo leh, Bal eega, Rabbigu wuxuu yimid
isagoo wata quduusiintiisii aan tirada lahayn, 15 inuu xukun
ku soo dejiyo kulli, iyo inuu kuwa aan cibaadada lahayn oo
dhan ku caddeeyo shuqulladoodii cibaadola'aanta ahaa oo
ay cibaadola'aanta ku sameeyeen, iyo waxyaalihii adkaa oo
dhan oo ay dembilayaasha aan cibaadada lahaynu isaga ka
sheegeen. 16 Kuwanu waa kuwa gunuunaca, oo cawda,
oo damacyadooda xaaraanta ah ka daba orda, afkooduna
wuxuu ku hadlaa hadallo isweyneyn ah, dadkana way u kala
eexdaan inay faa'iido helaan aawadeed. 17 Laakiinse idinku,
gacaliyayaalow, xusuusta hadalladii rasuulladii Rabbigeenna
Ciise Masiix ay hore idinkula hadleen. 18 Waxay idinku
yidhaahdeen, Ugu dambaysta waxaa jiri doona kuwa wax ku
majaajilooda, oo daba socda damacyadooda aan cibaadada
lahayn. 19 Kuwanu waa kuwa dadka kala erya, oo nafta
dunida u nool iyagoo aan Ruuxa lahayn. 20 Laakiinse,
gacaliyayaalow, nafsaddiinna ku dul dhisa rumaysadkiinna
aad quduuska u ah, oo Ruuxa Quduuska ah ku tukada,
21 nafsaddiinna ku haya jacaylka Ilaah, idinkoo sugaya
naxariista Rabbigeenna Ciise Masiix oo idin geeynaysa
nolosha weligeed ah. **(aiōnios g166)** 22 Kuwa shakisan u
naxariista; 23 qaarna dabka ka dhufta oo badbaadiya, qaarna
u naxariista idinkoo cabsanaya oo nacaya xataa dharka
jiidhka ku wasakhoobay. 24 Oo kan kara inuu turunturada
idinka ilaaliyo oo uu ammaantiisa idin hor taago, idinkoo aan
iin lahayn oo aad u faraxsan, 25 isagoo ah Ilaaha keligiis ah
oo Badbaadiyeheenna ah, ammaan iyo weynaan iyo xoog
iyo amar ha u ahaadeen xagga Rabbigeenna Ciise Masiix,
wakhtiga oo dhan ka hor iyo haatan iyo weligeedba. Aamiin.
**(aiōn g165)**

# Muujintii

1 Tanu waa muujintii Ciise Masiix oo Ilaah isaga siiyey
inuu tuso addoommadiisa waxyaalaha waajibka ah inay
dhowaan dhacaan. Oo isagu wuxuu taas tusay addoonkiisii
Yooxanaa isagoo malaa'igtiisa u soo diraya isaga, 2 kaasoo
ka markhaati furay erayga Ilaah iyo markhaatifuridda Ciise
Masiix, iyo wixii uu isagu arkay oo dhan. 3 Waxaa barakaysan
ka akhriya iyo kuwa maqla erayadii wax sii sheegidda, oo
xajiya waxyaalaha ku qoran, waayo, wakhtigii wuu dhow
yahay. 4 Anigoo Yooxanaa ah waxaan waxyaalahan u soo
qorayaa toddobada kiniisadood oo Aasiya ku yaal. Nimco
iyo nabadu ha idiinka yimaadeen kan jira oo jiray oo iman
doona, iyo xagga toddobada ruux oo carshigiisa hor jooga,
5 iyo xagga Ciise Masiix oo ah markhaatiga aaminka ah, iyo
curadka kuwii dhintay, iyo amiirka boqorrada dhulka. Kan
ina jecel oo dembiyadeenna dhiiggiisa inagaga furay, 6 oo
boqortooyo inaga dhigay inaynu wadaaddo u ahaanno Ilaaha
ah Aabbihiis, isaga ammaanu ha u ahaato iyo dowladnimo
weligiis iyo weligiisba. Aamiin. **(aiōn g165)** 7 Bal eega, wuxuu
la imanayaa daruuraha, oo waxaa isaga arki doona il kasta
iyo kuwii isaga wareemay; oo qabiilooyinka dhulka oo
dhammuna isagay u barooran doonaan. Haah, saas ha
ahaato. Aamiin. 8 Rabbiga Ilaaha ahu wuxuu leeyahay,
Anigu waxaan ahay Alfa iyo Oomeega, oo ah kan jira oo
jiray oo iman doona, iyo Qaadirka. 9 Anigoo Yooxanaa ah
oo walaalkiin ah iyo mid idinkala qayb galay dhibaatada
iyo boqortooyada iyo dulqaadashada ku jira Ciise, waxaan
gasiiradda Batmos la yidhaahdo u joogay erayga Ilaah iyo
u markhaatifuridda Ciise aawadood. 10 Maalintii Rabbiga
waxaan ku jiray Ruuxa, oo waxaan meel iga dambaysa
ka maqlay cod weyn oo ah sidii buun oo leh, 11 Wixii aad
aragtid buug ku qor, oo waxaad u sii dirtaa toddobada
kiniisadood; kuwaas oo ah tan Efesos, iyo tan Simurna,
iyo tan Bergamos, iyo tan Tu'ateyra, iyo tan Sardis, iyo
tan Filadelfiya, iyo tan La'odikiya. 12 Oo anna dib baan u
jeestay inaan arko codkii ila hadlay, oo markii aan dib u
jeestay waxaan arkay toddoba laambadood oo dahab ah. 13
Oo laambadaha badhtankooda waxaan ku arkay mid u eg
bini-aadan oo qaba khamiis dheer, oo laabtana waxaa ugu
xidhnaa suun dahab ah. 14 Oo madaxiisa iyo timihiisuna
waxay u caddaayeen sida suuf cad iyo sida baraf oo kale;
oo indhihiisuna waxay ahaayeen sida dab ololkiis, 15 oo
cagihiisuna waxay u ekaayeen naxaas dhalaalaysa sidii
iyadoo foorno lagu safeeyey, codkiisuna wuxuu u ekaa codka
biyo badan. 16 Oo gacantiisa midigtaana wuxuu ku haystay
toddoba xiddigood, oo afkiisana waxaa ka soo baxay seef
soofaysan oo laba af leh, jaahiisuna wuxuu u ekaa qorraxda
oo xoog u dhalaalaysa. 17 Oo markii aan arkay ayaan
ku hor dhacay sidii mid dhintay. Oo markaasuu gacantiisii
midigta ahayd i saaray, oo wuxuu igu yidhi, Ha cabsan. Anigu
waxaan ahay kan ugu horreeyey iyo kan ugu dambeeya,
18 iyo kan nool. Anigu waan dhintay, oo bal eeg, waan
noolahay tan iyo weligayba, oo waxaan haystaa furayaasha
dhimashada iyo Haadees. **(aiōn g165, Hadēs g86)** 19 Haddaba
waxaad qortaa waxyaalahaad aragtay iyo waxyaalaha hadda
jira iyo waxyaalaha hadda ka dib dhici doona. 20 Toddobada
xiddigood oo aad ku aragtay gacantayda midigtaa iyo
toddobada laambadood oo dahabka ah qarsoodigooda
micnihiisu waxaa weeye sidan, toddobada xiddigood waxaa
weeyaan malaa'igaha toddobada kiniisadood, toddobada
laambadoodna waxaa weeyaan toddobada kiniisadood.

2 Kiniisadda Efesos ku taal malaa'igteeda waxaad u qortaa:
Kan toddobada xiddigood gacantiisa midigtaa ku haystaa
oo toddobada laambadood oo dahabka badhtankooda ku
socdaa wuxuu kugu leeyahay waxyaalahan, 2 Waan ogahay
shuqulladaada, iyo hawshaada, iyo dulqaadashadaada,
iyo inaadan u adkaysan karin kuwa sharka ah, iyo inaad
tijaabisay kuwa rasuullada isku sheega iyagoo aan ahayn,
oo waxaad ogaatay inay been yihiin. 3 Waad dulqaadataa,
oo dhib baad ugu adkaysatay magacayga aawadiis, kamana
aad daalin. 4 Laakiin wax baan kuu haystaa, waayo,
jacaylkaagii hore waad ka tagtay. 5 Haddaba xusuuso
meeshii aad ka dhacday, oo toobadkeen, oo shuqulladaadii
hore samee; haddii kalese anigu waan kuu iman doonaa oo
laambaddaada waan ka qaadi doonaa meesheeda haddii
aadan toobadkeenin. 6 Laakiinse tan aad leedahay, waxaad
neceb tahay dadka Nikolas raaca shuqulladooda oo aan
aniguna necbahay. 7 Kii dheg lahu ha maqlo waxa Ruuxu
ku leeyahay kiniisadaha. Kii guulaysta ayaa waxaan siin
doonaa amar uu wax kaga cuno geedka nolosha oo ku
dhex yaal Firdooska Ilaah. 8 Kiniisadda Simurna ku taalna
malaa'igteeda waxaad u qortaa; Kan ugu horreeyey oo
ugu dambeeya, oo dhintay, oo soo noolaaday, wuxuu kugu
leeyahay waxyaalahan, 9 Waan ogahay dhibaatadaada
iyo faqiirnimadaada (laakiin taajir baad tahay), iyo cayda
ay kugu caayaan kuwa Yuhuudda isku sheegaa oo aan
ahayn, laakiinse ah kuwa sunagogga Shayddaanka. 10
Ha ka cabsan waxyaalaha aad dhowaan ku xanuunsan
doontid. Bal eega, in laydin tijaabiyo aawadeed, Ibliisku
qaarkiin buu dhowaan xabsi ku ridi doonaa, oo idinku intii
toban maalmood ah waxaad heli doontaan dhibaato. Ilaa
dhimashada aamin ahow, anna waxaan ku siin doonaa taajka

nolosha. 11 Kii dheg lahu ha maqlo waxa Ruuxu ku leeyahay
kiniisadaha. Kii guulaysta dhimashada labaad waxba yeeli
mayso. 12 Kiniisadda Bergamos ku taalna malaa'igteeda
waxaad u qortaa; Kan haysta seefta soofaysan oo labada af
leh wuxuu kugu leeyahay waxyaalahan, 13 Waan ogahay
meeshaad deggan tahay inay tahay meesha carshiga
Shayddaanku yaal; oo magacayga waad xajisaa, mana aad
inkirin iimaankayga xataa waagii Antibas joogay, isagoo
ahaa markhaatigaygii iyo kaygii aaminka ahaa oo dhexdiinna
lagu dilay meesha Shayddaanku deggan yahay. 14 Laakiinse
dhawr waxyaalood baan kuu haystaa, maxaa yeelay, halkaas
waxaad ku haysataa kuwo xajiya waxbariddii Balcaam, kaas
oo baray Baalaaq inuu reer binu Israa'iil hortooda ku tuuro
dhagax lagu turunturoodo, inay cunaan waxyaalo sanamyo
loo bixiyey iyo inay sinaystaan. 15 Weliba waxaad kaloo
haysataa kuwo sidaas oo kale u xajiya waxbariddii dadka
Nikolas raaca. 16 Haddaba sidaas daraaddeed toobadkeena,
haddii kalese dhaqsaan idiinku iman, oo waxaan iyaga kula
diriri doonaa seefta afkayga. 17 Kii dheg lahu ha maqlo
waxa Ruuxu ku leeyahay kiniisadaha. Kii guulaysta waxaan
wax ka siin doonaa maannada qarsoon, oo waxaan siin
doonaa dhagax cad, dhagaxa dushiisana waxaa ku qoran
magac cusub oo aan ninna aqoon, kan hela mooyaane.
18 Kiniisadda Tu'ateyra ku taalna malaa'igteeda waxaad u
qortaa; Wiilka Ilaah oo indhihiisu u eg yihiin dab ololkiis,
cagihiisuna u eg yihiin naxaas dhalaalaysaa wuxuu kugu
leeyahay waxyaalahan; 19 Waan ogahay shuqulladaada,
iyo jacaylkaaga, iyo rumaysadkaaga, iyo adeegiddaada, iyo
samirkaaga, iyo inay shuqulladaadii dambe ka sii badan
yihiin kuwaagii hore. 20 Laakiinse wax baan kuu haystaa,
waayo, waxaad oggoshahay naagta Yesebeel la yidhaahdo
oo nebiyad isku sheegta; oo waxay addoommadayda bartaa
oo ku sasabtaa inay sinaystaan oo ay cunaan waxyaalo
sanamyo loo bixiyey. 21 Oo waxaan iyada siiyey wakhti ay ku
toobadkeento, iyaduse dooni mayso inay ka toobadkeento
sinadeeda. 22 Bal eeg, haddaba iyada sariir baan ku dul
tuurayaa, oo kuwii iyada la sinaystana waxaan ku dhex
tuurayaa dhibaato weyn, haddii ayan ka toobadkeenin
shuqulladeeda. 23 Oo waxaan carruurteeda ku dili doonaa
dhimasho, kiniisadaha oo dhammuna waxay ogaan doonaan
inaan ahay kan baadhbaadha kelyaha iyo qalbiyada, oo
anna midkiin walbaba waxaan wax u siin doonaa sida
shuqulladiinnu yihiin. 24 Laakiinse intiinna kale oo Tu'ateyra
joogta, in alla intiinna aan waxbariddan haysan, oo sida ay
iyagu yidhaahdaan, aan aqoon waxyaalaha moolka dheer
oo Shayddaanka, idinka waxaan idinku leeyahay, Dushiinna
culaab kale saari maayo. 25 Habase yeeshee waxa aad
haysataan xajiya ilaa aan imaado. 26 Kii guulaysta oo
shuqulladayda sii xajiya tan iyo ugu dambaysta, waxaan siin
doonaa amar uu ku xukumo quruumaha. 27 Oo wuxuu ku
xukumi doonaa ul bir ah, sida weelasha dheriyasameeyuhu
ay u burburaan; sida aan aniguba Aabbahay uga helay: 28
oo weliba waxaan siin doonaa xiddigta waaberi. 29 Kii dheg
lahu ha maqlo waxa Ruuxu ku leeyahay kiniisadaha.

3 Kiniisadda Sardis ku taalna malaa'igteeda waxaad
u qortaa; Kan haysta toddobada Ruux oo Ilaah iyo
toddobada xiddigood, wuxuu kugu leeyahay waxyaalahan:
Waan ogahay shuqulladaada, oo magac baad leedahay
sida wax nool, laakiinse meyd baad tahay. 2 Haddaba soo
jeed, oo adkee waxyaalaha kuu hadhay oo dhimashada ku
dhow; waayo, shuqulladaadii ma aan helin iyagoo kaamil
ku ah Ilaahayga hortiisa. 3 Haddaba sidaas daraaddeed
xusuuso sidii aad u heshay oo aad u maqashay, oo xaji, oo
toobadkeen. Laakiinse haddii aadan soo jeedin, waxaan u
iman doonaa sida tuug oo kale, mana aad ogaan doontid
saacadda aan kuu iman doono. 4 Laakiinse waxaad Sardis
ku leedahay dhawr qof oo aan dharkooda nijaasayn; oo
anigay ila socon doonaan iyagoo dhar cad qaba; maxaa
yeelay, way istaahilaan. 5 Kii guulaystaa sidaasuu u xidhan
doonaa dhar cad; oo anna sinaba magiciisa ugama tirtiri
doono kitaabka nolosha, oo waxaan magiciisa ka qiran
doonaa Aabbahay hortiisa iyo malaa'igihiisa hortooda. 6 Kii
dheg lahu ha maqlo waxa Ruuxu ku leeyahay kiniisadaha. 7
Kiniisadda Filadelfiya ku taalna malaa'igteeda waxaad u
qortaa; Kan quduuska ah, oo runta ah, oo furihii Daa'uud
haysta, oo wuxuu furo aanu ninna xidhi karin, wuxuu xidhana
aanu ninna furi karin, wuxuu kugu leeyahay waxyaalahan; 8
Waan ogahay shuqulladaada (oo bal eeg, waxaan hortaada
dhigay albaab furan oo aanu ninna xidhi karin), waayo,
waxaad leedahay waxoogaa xoog ah, oo eraygaygiina waad
dhawrtay, oo magacaygiina ma aad inkirin. 9 Bal eeg, kuwa
isku sheega Yuhuud oo aan ahayn ee beenta sheegaya
waxaan ka keeni doonaa sunagogga Shayddaanka, oo bal
eeg, iyaga waxaan ka dhigi doonaa inay yimaadaan oo ay
cagahaaga hortooda ku sujuudaan oo ay ogaadaan inaan
anigu ku jeclahay. 10 Adigu waxaad dhawrtay ereygayga oo
aad dulqaadatay, oo sidaas daraaddeed waxaan kaa dhawri
doonaa saacadda jirrabaadda oo dhowaan u imanaysa
dunida oo dhan inay jirrabto kuwa dhulka deggan. 11
Anigu dhaqsaan u imanayaa. Haddaba xaji waxaad haysatid
si aan ninna taajkaaga kaaga qaadin. 12 Kii guulaysta
waxaan ka dhigi doonaa tiir ku jira macbudka Ilaahayga,
halkaasna mar dambe kama bixi doono, oo waxaan dushiisa

ku qori doonaa magaca Ilaahayga, iyo magaca magaalada
Ilaahayga, taas oo ah Yeruusaalemta cusub, oo samada
iyo xagga Ilaahayga ka soo degaysa, iyo xataa magacayga
cusub. 13 Kii dheg lahu ha maqlo waxa Ruuxu ku leeyahay
kiniisadaha. 14 Kiniisadda La'odikiya ku taalna malaa'igteeda
waxaad u qortaa; Aamiin, oo ah markhaatiga aaminka
ah oo runta ah, oo ah madaxa uunka Ilaah, wuxuu kugu
leeyahay waxyaalahan; 15 Waan ogahay shuqulladaada iyo
inaadan qabow iyo kulayl midna ahayn. Waxaan jeclaan
lahaa inaad tahay qabow iyo kulayl midkood. 16 Haddaba
waad diirran tahay, oo qabow iyo kulayl midna ma ihid,
sidaas daraaddeed afkaygaan kaa tufi doonaa. 17 Waxaad
tidhaahdaa, Taajir baan ahay, oo maal baan helay, oo waxba
uma baahni, oo ma ogid inaad tahay tan belaysan, oo loo
naxo, oo miskiinka ah, oo indhaha la', oo qaawan. 18 Sidaas
daraaddeed waxaan kugula talinayaa inaad iga iibsatid
dahab dab lagu safeeyey, si aad taajir u noqotid, iyo dhar
cad si aad u xidhatid oo aanay ceebta qaawanaantaadu u
muuqan, iyo indhakuul aad indhaha marsatid si aad wax
u aragtid. 19 In alla inta aan jeclahay waan canaantaa oo
edbiyaa, sidaas daraaddeed qiiro yeelo oo toobadkeen. 20
Bal eeg, albaabkaan taaganahay oo garaacayaa; haddaba
haddii nin codkayga maqlo oo albaabka iga furo, waan u soo
gelayaa, oo waan la cashayn, isna wuu ila cashayn. 21 Kii
guulaysta, waxaan siin doonaa amar uu carshigayga igula
fadhiisto, sida aan aniguba u guulaystay, oo aan Aabbahay
ugula fadhiistay carshigiisa. 22 Kii dheg lahu ha maqlo waxa
Ruuxu ku leeyahay kiniisadaha.

**4** Waxyaalahaas dabadeed kor baan eegay oo waxaan
arkay albaab samada ka furmay, oo codkii ugu horreeyey
oo aan maqlay sidii buun ila hadlaya oo kale, wuxuu
igu yidhi, Halkan soo fuul oo waxaan ku tusi doonaa
waxyaalaha waajibka ah inay hadda ka dib dhacaan. 2
Haddiiba waxaan ku jiray Ruuxa, oo bal eeg, waxaa jiray
carshi samada qotoma, oo mid baa carshigii ku fadhiyey, 3
oo kii fadhiyey midabkiisu wuxuu u ekaa dhagax yasbid iyo
dhagax sardiyos, oo carshigana waxaa ku wareegsanaa
qaansoroobaad midabkeedu u eg yahay dhagax sumurud.
4 Oo carshigii hareerihiisana waxaa yiil afar iyo labaatan
carshi oo kale; oo carshiyadii dushoodana waxaan ku
arkay afar iyo labaatan oday oo ku fadhiya, oo dhar cad
qaba; madaxana waxaa u saarnaa taajaj dahab ah. 5
Oo carshigiina waxaa ka soo baxay hillaac iyo codad iyo
onkod. Oo waxaa jiray toddoba laambadood oo dab ah
oo carshiga hortiisa ka ololaya, kuwaas oo ah toddobada
Ruux oo Ilaah. 6 Oo carshigii hortiisana waxaa yiil wax la
mid ah bad muraayad ah oo u eg madarad, oo carshiga
badhtankiisa iyo carshiga hareerihiisa waxaa joogay afar
xayawaan oo hor iyo dibba indho miidhan ah. 7 Xayawaankii
kowaad wuxuu u ekaa libaax, xayawaankii labaadna wuxuu
u ekaa weyl, xayawaankii saddexaadna wuxuu lahaa weji
u eg weji nin, xayawaankii afraadna wuxuu u ekaa gorgor
duulaya. 8 Oo afarta xayawaan mid waluba wuxuu lahaa
lix baal, oo hareerahooda iyo gudahooduba waa indho
miidhan; oo habeen iyo maalin midna ma nastaan, oo waxay
yidhaahdaan, Quduus, quduus, quduus waxaa ah Rabbiga
ah Ilaaha Qaadirka ah, oo jiray oo jira oo iman doona. 9
Oo marka xayawaanku ay ammaanaan oo ciseeyaan oo
mahad u naqaan kan carshiga ku fadhiya oo ah kan nool
weligiis iyo weligiis, (aiōn g165) 10 ayaa afar iyo labaatanka
oday waxay ku hor dhici doonaan kan carshiga ku fadhiya,
oo waxay caabudi doonaan kan nool weligiis iyo weligiis, oo
taajajkoodana waxay ku tuuri doonaan carshiga hortiisa,
iyagoo leh, (aiōn g165) 11 Rabbigayagow, Ilaahayagow, adigu
waad istaahishaa inaad heshid ammaanta iyo cisada iyo
xoogga, waayo, wax kasta adaa abuuray, maxaa yeelay,
doonistaada aawadeed ayay u ahaadeen oo u abuurmeen.

**5** Oo anna kii carshiga ku fadhiyey gacantiisa midigta
waxaan ku arkay kitaab wax kaga qoran yihiin dul iyo
hoosba, oo waxaa ku shaabadaysnaa toddoba shaabadood.
2 Oo waxaan arkay malaa'ig xoog weyn oo ku naadinaysa
cod weyn, oo leh, Bal yaa istaahila inuu kitaabka kala bixiyo
oo uu furo shaabadihiisa? 3 Oo samada, iyo dhulka dushiisa,
iyo dhulka hoostiisa laguma arag mid awooda inuu kitaabka
kala bixiyo ama eego. 4 Oo markaasaan aad u ooyay, maxaa
yeelay, lama helin mid istaahila inuu kitaabka kala bixiyo ama
eego. 5 Markaasaa odayaashii midkood wuxuu igu yidhi, Ha
ooyin, bal eeg, Libaaxa qabiilka reer Yahuudah ka mid ah
oo ah xididkii ka yimid Daa'uud ayaa wuxuu ku guulaystay
inuu furo kitaabka iyo toddobadiisa shaabadoodba. 6 Oo
carshiga badhtankiisii iyo afarta xayawaan iyo odayaasha
badhtankoodii waxaan ku arkay Wan taagan oo ah sida mid
la gowracay oo leh toddoba gees iyo toddoba indhood oo ah
toddobada Ruux oo Ilaah, oo loo soo diray dunida oo dhan.
7 Oo isna intuu yimid ayuu kitaabkii ka qaatay kii carshigii
ku fadhiyey gacantiisii midigtaa. 8 Oo markuu kitaabkii
qaatay ayaa afartii xayawaan iyo afar iyo labaatankii odayba
waxay ku dhaceen Wankii hortiisa iyagoo midkood waluba
wato kataarad iyo fijaanno dahab ah oo foox ka buuxo oo
ah baryadii quduusiinta. 9 Oo waxay ku gabyeen gabay
cusub iyagoo leh, Adigu waxaad istaahishaa inaad kitaabka
qaadato oo aad shaabadihiisa furto; waayo, waa lagu
gowracay, oo waxaad Ilaah dhiiggaaga ugu soo iibisay dad

ah qabiil kasta iyo af kasta iyo dad kasta iyo quruun kasta,
**10** oo waxaad iyagii ka dhigtay inay Ilaaheenna u ahaadaan
boqortooyo iyo wadaaddo; oo iyana dhulka ayay wax ku
xukumi doonaan. **11** Oo anna carshigii iyo xayawaanadii iyo
odayaasha hareerahoodii waxaan ku arkay oo ka maqlay
malaa'igo badan codkood, oo tiradooduna waxay ahayd
toban kun oo meelood oo min toban kun ah, iyo kumaan
kun; **12** oo waxay cod weyn ku lahaayeen, Istaahil waxaa ah
Wankii la gowracay inuu helo xoog, iyo maal, iyo xigmad, iyo
itaal, iyo ciso, iyo ammaan, iyo mahad. **13** Oo wax kasta
oo la abuuray oo ku jira samada, iyo dhulka dushiisa, iyo
dhulka hoostiisa, iyo badda gudaheeda, iyo waxyaalaha
iyaga ku jira oo dhan, ayaa waxaan maqlay iyagoo leh, Kan
carshiga ku fadhiya iyo Wanka ha u ahaadeen mahad, iyo
ciso, iyo ammaan, iyo xoog, weligood iyo weligood. **(aiōn
g165)** **14** Markaasaa afartii xayawaan waxay yidhaahdeen,
Aamiin. Odayaashiina way dhaceen oo sujuudeen.

**6** Oo waan arkayay markii Wankii furay toddobadii
shaabadood middood, oo waxaan maqlay afartii xayawaan
midkood oo codkiisa la moodo onkod leh, Kaalay oo arag. **2**
Oo bal eeg, waxaan arkay faras cad oo kii fuushanaana
wuxuu haystay qaanso, oo waxaa isaga la siiyey taaj;
oo wuxuu soo baxay isagoo guulaysanaya, wuxuuna u
soo baxay inuu guulaysto. **3** Oo haddana markii uu furay
shaabaddii labaad ayaa waxaan maqlay xayawaankii labaad
oo leh, Kaalay oo arag. **4** Markaasaa waxaa soo baxay faras
kale oo xamar ah; oo kii fuushanaana waxaa la siiyey amar
inuu dunida nabadda ka qaado iyo in dadka midba midka
kale dilo; oo waxaa la siiyey seef weyn. **5** Oo haddana
markuu shaabadda saddexaad furay ayaa waxaan maqlay
xayawaankii saddexaad oo leh, Kaalay oo arag. Oo bal
eeg, waxaan arkay faras madow; oo kii fuushanaana wuxuu
gacanta ku haystay miisaan. **6** Oo waxaan afartii xayawaan
badhtankooda ka maqlay wax cod la moodo oo leh, Koombo
sarreen ah qiimaheedu waa dinaar, saddex koombo oo
shaciir ahna qiimahoodu waa dinaar, saliidda iyo khamrigana
wax ha yeelin. **7** Oo haddana markuu furay shaabaddii
afraad ayaa waxaan maqlay xayawaankii afraad codkiisii oo
leh, Kaalay oo arag. **8** Oo bal eeg, waxaan arkay faras cirro
leh; oo kii fuushanaana magiciisu wuxuu ahaa Dhimasho; oo
waxaa la socday Haadees. Oo waxaa iyaga la siiyey amar
ay ku xukumaan dunida waaxdeed oo ay ku laayaan seef,
iyo abaar, iyo dhimasho, iyo dugaagga dhulka. **(Hadēs g86)**
**9** Oo haddana markuu furay shaabaddii shanaad waxaan
meeshii allabariga hoosteeda ku arkay nafihii kuwii loo dilay
eraygii Ilaah aawadiis, iyo markhaatigii ay fureen aawadiis,
**10** oo iyana waxay ku dhawaaqeen cod weyn iyagoo leh,
Sayidkayaga quduuskaa oo runtahow, ilaa goormaadan
xukumayn oo aadan dhiigayaga nooga aarayn kuwa dhulka
jooga? **11** Oo midkood kastaba waxaa la siiyey khamiis cad;
oo waxaa loo sheegay inay wakhti yar sii nastaan ilamaa
kuwa iyaga addoommada la ah iyo walaalahooda dhowaan
sidoodii oo kale loo dili doono ay soo dhammaadaan. **12** Oo
haddana waxaan arkay markii uu furay shaabaddii lixaad,
markaasaa waxaa dhacay dhulgariir weyn; oo qorraxduna
waxay u madoobaatay sidii joonyad dhogor ah, oo dayaxii oo
dhammuna wuxuu noqday sidii dhiig oo kale; **13** oo xiddigihii
samaduna waxay ku soo daateen dhulka sida geed berde
ahi u tuuro midhihiisa aan bislaan markii dabayl weyni ruxdo.
**14** Oo samadiina waxaa loo qaaday sidii kitaab la duubay oo
kale, oo buur walba iyo gasiirad walbaba meeshoodii waa
laga dhaqaajiyey. **15** Oo boqorradii dunida, iyo amiirrada,
iyo saraakiisha sare, iyo taajiriinta, iyo kuwa xoogga weyn
ah, iyo addoon kasta iyo mid kasta oo xor ahuba, waxay
ku dhuunteen godadka iyo dhagaxyada buuraha; **16** oo
waxay ku yidhaahdeen buurihii iyo dhagaxyadii, Nagu soo
dhaca oo naga qariya kan carshiga ku fadhiya wejigiisa iyo
cadhada Wanka, **17** waayo, waxaa timid maalintii weynayd
oo cadhadooda; bal yaa awooda inuu istaago?

**7** Taas dabadeed waxaan arkay afar malaa'igood oo taagan
afarta gees oo dhulka, oo xajinaya afarta dabaylood, si
aan dabaylu ugu dhicin dhulka ama badda ama dhirta. **2**
Oo waxaan arkay malaa'ig kale oo ka soo baxaysa qorrax
ka soo baxa oo haysata shaabadda Ilaaha nool; oo cod
weyn bay ugu dhawaaqday afartii malaa'igood oo amarka
lagu siiyey inay wax yeelaan dhulka iyo badda, oo waxay
ku tidhi, **3** Waxba ha yeelina dhulka iyo badda iyo dhirta
toona, jeer aannu addoommada Ilaahayaga wejiga ka
shaabadayno. **4** Oo waxaan maqlay intoodii la shaabadeeyey
tiradoodii, waxayna ahaayeen boqol iyo afar iyo afartan
kun oo intaasaa laga shaabadeeyey qabiilooyinka reer binu
Israa'iil oo dhan. **5** Qabiilka reer Yahuudah waxaa laga
shaabadeeyey laba iyo toban kun; Qabiilka reer Ruubeenna
waxaa laga shaabadeeyey laba iyo toban kun; Qabiilka
reer Gaadna waxaa laga shaabadeeyey laba iyo toban
kun; **6** Qabiilka reer Aasheerna waxaa laga shaabadeeyey
laba iyo toban kun; Qabiilka reer Naftaalina waxaa laga
shaabadeeyey laba iyo toban kun; Qabiilka reer Manasehna
waxaa laga shaabadeeyey laba iyo toban kun; **7** Qabiilka
reer Simecoonna waxaa laga shaabadeeyey laba iyo toban
kun; Qabiilka reer Laawina waxaa laga shaabadeeyey
laba iyo toban kun; Qabiilka reer Isaakaarna waxaa laga
shaabadeeyey laba iyo toban kun; **8** Qabiilka reer Sebulunna

waxaa laga shaabadeeyey laba iyo toban kun; Qabiilka reer
Yuusufna waxaa laga shaabadeeyey laba iyo toban kun;
Qabiilka reer Benyaamiinna waxaa laga shaabadeeyey laba
iyo toban kun. 9 Oo bal eeg, waxyaalahaas ka dib waxaan
arkay dad faro badan, oo aan ninna tirin karin, oo lagala
soo baxay quruun kasta, iyo qabiil kasta, iyo dad kasta, iyo
af kasta, oo taagan carshiga hortiisa iyo Wanka hortiisa,
iyagoo qaba khamiisyo cadcad, gacmahana ku haysta
caleemo timireed. 10 Oo iyana waxay ku dhawaaqeen cod
weyn, iyagoo leh, Badbaado waxaa leh Ilaahayaga carshiga
ku fadhiya iyo Wanka. 11 Oo malaa'igihii oo dhammuna
waxay taagnaayeen carshiga hareerihiisa iyo odayaashii iyo
afartii xayawaan hareerahooda; oo carshiga hortiisii ayay
ku dhaceen oo intay wejigooda dhulka saareen ayay Ilaah
caabudeen, 12 iyagoo leh, Aamiin; Ilaahayagu weligiis iyo
weligiis ha lahaado barako, iyo ammaan, iyo xigmad, iyo
mahad, iyo ciso, iyo xoog, iyo itaal. Aamiin. (aiōn g165) 13
Oo odayaashii midkood baa jawaabay oo wuxuu igu yidhi,
Kuwan khamiisyada cadcad qabaa yay yihiin, xaggee bayse
ka yimaadeen? 14 Oo waxaan ku idhi, Sayidkaygiiyow, waad
taqaan. Markaasuu wuxuu igu yidhi, Kuwanu waa kuwii ka
soo baxay dhibaatadii weynayd, oo waxay khamiisyadoodii
ku maydheen oo ku caddeeyeen dhiiggii Wanka. 15 Sidaas
daraaddeed waxay joogaan carshiga Ilaah hortiisa; oo waxay
isaga ugu adeegaan macbudkiisa habeen iyo maalinba; oo
kan carshiga ku fadhiyaana wuxuu dushooda ka dhisan
doonaa taambuuggiisa. 16 Oo iyana mar dambe ma ay
gaajoon doonaan, mana ay harraadi doonaan mar dambe,
qorraxda iyo kulaylkuna kuma ay dhici doonaan; 17 waayo,
Wanka carshiga badhtankiisa jooga ayaa wuxuu ahaan
doonaa adhijirkooda, oo wuxuu iyaga u hoggaamin doonaa
ilaha biyaha nolosha; oo Ilaahna indhahooda ilmo kastuu ka
tirtiri doonaa.

**8** Oo haddana markuu furay shaabaddii toddobaad, intii
nus saac ah waxaa samada ka dhacday aamusnaan. 2
Markaasaan waxaan arkay toddobadii malaa'igood oo Ilaah
hortiisa taagan, oo waxaa la siiyey toddoba buun. 3 Oo
haddana waxaa timid malaa'ig kale, oo waxay is-ag taagtay
meeshii allabariga, iyadoo haysata idan dahab ah, oo waxaa
la siiyey foox badan si ay ugu darto baryadii quduusiinta
oo dhan oo ay ugu shiddo meeshii allabariga oo dahabka
ahayd oo carshiga hortiisa tiil. 4 Oo qiiqii fooxa oo ay
baryadii quduusiintu la socoto ayaa wuxuu ka baxay gacantii
malaa'igta oo wuxuu kor u aaday Ilaah hortiis. 5 Markaasaa
malaa'igtii waxay qaadatay idankii, oo waxay ka buuxisay
dabkii meesha allabariga, kolkaasay waxay ku tuurtay
dhulka; markaasaa waxaa dhacay onkod, iyo codad, iyo
hillaac, iyo dhulgariir. 6 Markaasaa toddobadii malaa'igood
oo toddobada buun haystay waxay isu diyaariyeen inay ka
dhawaajiyaan. 7 Malaa'igtii kowaad ayaa ka dhawaajisay,
markaasaa waxaa soo dhacay roob dhagaxyaale iyo dab
dhiig ku dhex qasan yahay, oo waxaa lagu tuuray dhulka;
markaasaa dunida saddex meelood oo meeli gubatay, oo
dhirtana saddex meelood oo meel baa gubatay, oo cawskii
qoyanaa oo dhammuna waa gubtay. 8 Oo haddana waxaa ka
dhawaajisay malaa'igtii labaad, markaasaa waxaa badda lagu
tuuray wax le'eg buur weyn oo dab ka ololayo; markaasaa
baddii saddex meelood oo meel baa dhiig noqotay; 9 oo
waxaa halkaas ku dhintay uunkii badda ku jiray oo nafta
lahaa saddex meelood oo meel, oo doonniyihiina saddex
meelood oo meel baa la baabbi'iyey. 10 Oo haddana waxaa
ka dhawaajisay malaa'igtii saddexaad, markaasaa waxaa
samada ka soo dhacday xiddig weyn oo sidii laambadeed
u ololaysa, oo waxay ku dul dhacday webiyaasha saddex
meelood oo meel, iyo ilihii biyaha ahaa; 11 oo xiddigta
magaceedana waxaa la yidhaahdaa Qadhaadh; oo biyihiina
saddex meelood oo meel baa qadhaadh noqotay; dad
badanuna wuxuu ku dhintay biyihii, maxaa yeelay, qadhaadh
baa laga dhigay. 12 Oo haddana waxaa ka dhawaajisay
malaa'igtii afraad, markaasaa waxaa wax lagu dhuftay
qorraxda saddex meelood oo meel, iyo dayaxa saddex
meelood oo meel, iyo xiddigaha saddex meelood oo meel, in
saddex meelood oo meeli ay gudcur noqoto, iyo in maalinta
saddex meelood oo meeli aanay iftiimin, habeenkuna uu
noqdo sidaas oo kale. 13 Haddana waxaan arkay oon
maqlay gorgor dhex duulaya samada isagoo cod weyn ku
leh, Waxaa hoogay oo hoogay oo hoogay kuwa dhulka
deggan, sababtuna waa buunanka dhawaaqooda hadhay oo
saddexda malaa'igood ay dhowaan ka dhawaajin doonaan.

**9** Oo haddana waxaa ka dhawaajisay malaa'igtii shanaad,
markaasaan arkay xiddig samada ka timid oo dhulka
ku soo dhacday; oo waxaa iyadii la siiyey furihii ceelka
yamayska. (Abyssos g12) 2 Markaasay waxay furtay ceelkii
yamayska, oo ceelkii waxaa kor uga soo baxay qiiq u eg qiiq
foorno weyn; oo qiiqii ceelka aawadiis ayaa qorraxdii iyo
hawadiiba gudcur la noqdeen. (Abyssos g12) 3 Markaasaa
qiiqii waxaa ka soo baxay oo dhulka ku soo degay ayax; oo
waxaa iyagii la siiyey xoog sida hangarallayaasha dhulku ay
xoog u leeyihiin. 4 Oo waxaa lagu yidhi, Waxba ha yeelina
cawska dhulka iyo wax cagaar ah iyo geednaba, dadka aan
shaabadda Ilaah wejiga ku lahayn mooyaane. 5 Oo haddana
waxaa lagu amray inaanay dadka dilin, laakiinse inay intii

shan bilood ah xanuujiyaan, oo xanuunkooduna wuxuu
ahaa sida xanuunka hangarallahu markuu nin qaniino. 6 Oo
ayaamahaasna dadku waxay doondooni doonaan dhimasho,
oo sinaba uma ay heli doonaan, oo waxay jeclaan doonaan
inay dhintaan, laakiinse dhimashadu way ka carari doontaa
iyaga. 7 Oo ayaxa qaabkiisuna wuxuu u ekaa fardo dagaal
loo diyaariyey; oo madaxana waxaa u saarnaa taajaj dahab
u eg, oo wejiyadooduna waxay u ekaayeen wejiyo dad. 8 Oo
waxay lahaayeen timo u eg timo dumar; ilkahooduna waxay
u ekaayeen ilko libaax. 9 Oo waxay lahaayeen laabdhawr u
eg laabdhawr bir ah; oo sanqadha baallahooduna waxay
u ekayd sanqadh fardo badan oo dagaal ku yaacaya
gaadhifardoodkood. 10 Oo waxay lahaayeen dabo u eg
hangarallayaasha dabadooda iyo miciyo; oo dabadoodana
waxay ku lahaayeen xoog ay dadka wax ku yeelaan intii
shan bilood ah. 11 Oo waxaa iyaga boqor u ah malagga
yamayska; oo magiciisana afka Cibraaniga waxaa lagu
yidhaahdaa Abaddoon; afka Gariiggana magiciisa waxaa
lagu yidhaahdaa Abolyoon. **(Abyssos g12)** 12 Hooggii kowaad
wuu dhammaaday; oo bal eeg, weli waxaa dhiman oo hadda
ka dib imanaya laba hoog oo kale. 13 Oo haddana waxaa ka
dhawaajisay malaa'igtii lixaad, markaasaan maqlay cod ka
yeedhaya geesihii girgirihii allabariga oo dahabka ahaa oo
Ilaah hor yaal, 14 oo ku lahaa malaa'igtii lixaad oo buunka
haysatay, Fur afarta malaa'igood oo ku ag xidhan webiga
weyn oo Yufraad. 15 Markaasaa waxaa la furay afartii
malaa'igood oo loo diyaariyey saacadda iyo maalinta iyo
bisha iyo sannadda inay laayaan dadka saddex meelood oo
meel. 16 Oo tiradii ciidankii fardooleyda ahaa waxay ahayd
labaatan kun oo meelood oo min toban kun ah; oo anigu
waan maqlay tiradoodii. 17 Oo sidaasaa waxaan tusintii
ku arkay fardihii iyo kuwii fuushanaa oo qaba laabdhawr
u eg dab iyo dhagax yakintos iyo baaruud; oo fardaha
madaxyadooduna waxay u ekaayeen madaxyo libaax; oo
afafkoodana waxaa ka soo baxayay dab iyo qiiq iyo baaruud.
18 Oo dadkii saddex meelood oo meel waxaa lagu dilay
saddexdan belaayo oo ah dabka iyo qiiqa iyo baaruudda
afkoodii ka soo baxay. 19 Waayo, fardaha xooggoodu wuxuu
ku jiray afkooda iyo dabadooda, waayo, dabadoodu waxay
u ekayd abeesooyin, oo waxay lahaayeen madaxyo, oo
kuwaasay dadka wax ku yeeli jireen. 20 Oo dadkii hadhay oo
aan lagu dilin saddexdaas belaayo, kama ay toobadkeenin
shuqulladii gacmahooda, si ayan u caabudin jinniyo, iyo
sanamyo dahab ah, iyo kuwo lacag ah, iyo kuwo naxaas
ah, iyo kuwo dhagax ah, iyo kuwo qoryo ah, oo aan wax
arki karin, waxna maqli karin, soconna karin; 21 kamana ay
toobadkeenin diliddoodii iyo saaxirnimadoodii iyo sinadoodii
iyo tuugnimadoodii.

**10** Oo haddana waxaan arkay malaa'ig kale oo xoog weyn
oo samada ka soo degaysa, iyadoo daruur huwan,
madaxeedana waxaa saarnaa qaansoroobaad, wejigeeduna
wuxuu u ekaa qorraxda oo kale, cagaheeduna waxay u
ekaayeen tiirar dab ah, 2 oo gacanteedana waxay ku
haysatay buug yar oo furan. Oo cagteedii midig waxay
saartay badda, teedii bidixdana waxay saartay dhulka, 3 oo
markaasay ku dhawaaqday cod weyn oo u eg libaax ciyaya,
oo markay qaylisay ayaa toddobadii onkodba onkodeen. 4
Oo markii toddobadii onkod onkodeen, waxaan ku dhowaa
inaan wax qoro; markaasaan maqlay cod samada ka leh,
Shaabad ku xidh waxyaalaha toddobada onkod ay ku
onkodeen, oo ha qorin. 5 Markaasaa malaa'igtii aan arkay
oo ku taagnayd badda iyo dhulka ayaa gacanteedii midig
samada kor ugu taagtay, 6 oo inaan wakhti mar dambe
jirayn ayay ugu dhaaratay kan weligiis iyo weligiisba nool, oo
abuuray samada iyo waxyaalaha ku dhex jira, iyo dhulka
iyo waxyaalaha ku dhex jira, iyo badda iyo waxyaalaha ku
dhex jiraba. **(aiōn g165)** 7 Laakiinse wakhtiga codka malaa'igta
toddobaad markay ku dhow dahay inay ka dhawaajiso
ayaa waxaa dhammaan doona qarsoodiga Ilaah siduu ugu
bishaareeyey nebiyadii addoommadiisa ahaa. 8 Oo haddana
waxaan mar kale maqlay codkii aan samada ka maqlay
oo igu leh, Tag oo qaado buugga furan oo ku jira gacanta
malaa'igta ku taagan badda iyo dhulka. 9 Markaasaan
malaa'igtii u tegey, oo waxaan ku idhi, Buugga yar i sii.
Markaasay igu tidhi, Qaado oo cun; oo wuxuu calooshaada
ka dhigi doonaa qadhaadh, laakiin intuu afkaaga ku jiro
wuxuu u macaanaan doonaa sida malab oo kale. 10
Markaasaan buuggii yaraa ka qaatay malaa'igta gacanteedii,
waanan cunay, oo intuu afkayga ku jiray wuxuu u macaanaa
sida malab oo kale; oo markii aan cunay ayaa calooshaydii
qadhaadh noqotay. 11 Oo iyana waxay igu tidhi. Waa inaad
mar kale wax ka sii sheegtid dad badan iyo quruumo badan
iyo afaf badan iyo boqorro badan.

**11** Markaasaa waxaa lay siiyey cawsduur ul u eg, oo
waxaa laygu yidhi, Sara joogso, oo qiyaas macbudka
Ilaah, iyo meesha allabariga, iyo kuwa Ilaah ku caabuda
meeshaas. 2 Oo barxadda macbudka dibaddiisa ku taal
iska daa, oo ha qiyaasin; waayo, iyada waxaa la siiyey
quruumaha; oo magaalada quduuska ahna waxay ku tuman
doonaan intii laba iyo afartan bilood ah. 3 Oo labadayda
markhaati waxaan siin doonaa xoog ay wax ku sii sheegaan
kun iyo laba boqol iyo lixdan maalmood, iyagoo jawaanno

qaba. 4 Oo kuwanu waa labada geed oo saytuunka ah
iyo labada laambadood oo hor taagan Rabbiga dhulka. 5
Oo haddii nin damco inuu wax yeelo, dab baa afkooda
ka soo bixi doona oo gubi doona cadaawayaashooda; oo
haddii nin damco inuu wax yeelo, waa in saas loo dilo. 6
Kuwanu waxay leeyihiin amar ay samada ku xidhaan, si
aan roob u di'in inta ay wax sii sheegayaan, oo waxay
kaloo leeyihiin amar ay biyaha dhiig kaga dhigaan oo ay
dhulkana ugu soo dejiyaan belaayo kasta mar alla markii ay
doonayaan. 7 Oo markii ay dhammeeyaan markhaatifuridda
waxaa la diriri doonaa bahalka yamayska ka soo bixi
doona, oo wuu ka adkaan doonaa, wuuna dili doonaa
iyaga. (Abyssos g12) 8 Oo meydadkoodu waxay oolli doonaan
jidka magaalada weyn oo xagga ruuxa laga yidhaahdo
Sodom iyo Masar, halkaasoo Rabbigooda iskutallaabta lagu
qodbay. 9 Oo saddex maalmood iyo badh ayaa waxaa
meydadkooda daawan doona dad ka yimid dadadka iyo
qabiilooyinka iyo afafka iyo quruumaha; oo umana ay
oggolaan doonaan in meydadkooda qabri la geliyo. 10 Oo
kuwa dhulka degganuna way ku farxi doonaan oo rayrayn
doonaan, oo midkoodba midka kale wuxuu u diri doonaa
hadiyado; maxaa yeelay, labadan nebi waxay saxariiriyeen
kuwa dhulka deggan. 11 Oo saddex maalmood iyo badh
dabadeed waxaa iyaga soo gashay neeftii nolosha oo xagga
Ilaah ka timid, markaasay cagahoodii ku istaageen; oo kuwii
iyaga daawadayna waxaa ku soo degtay cabsi weyn. 12 Oo
waxay samada ka maqleen cod weyn oo ku leh, Halkan soo
fuula. Markaasay samada tegeen iyagoo daruur ku dhex jira,
oo cadaawayaashoodiina way arkeen. 13 Oo saacaddaasna
waxaa dhacay dhulgariir weyn, oo magaaladii toban meelood
oo meel ayaa duntay; oo dhulgariirkii wuxuu dilay toddoba
kun oo qof, oo intoodii kalena way cabsadeen, oo waxay
ammaaneen Ilaaha samada. 14 Oo hooggii labaadna wuu
dhammaaday; oo bal eeg, hooggii saddexaadna dhaqsuu u
imanayaa. 15 Markaasaa waxaa ka dhawaajisay malaa'igtii
toddobaad, oo waxaa samada ka yeedhay codad waaweyn,
oo waxay yidhaahdeen, Boqortooyadii dunidu waxay noqotay
boqortooyadii Rabbigeenna iyo Masiixiisa, oo isna boqor buu
ahaan doonaa weligiis iyo weligiis. (aiōn g165) 16 Oo afar iyo
labaatankii oday oo carshiyadooda ku fadhiyey Ilaah hortiisa
way dhaceen, oo intay wejigooda dhulka saareen, ayay
Ilaah caabudeen, iyagoo leh, 17 Rabbiyow Ilaaha Qaadirkaa
oo jira oo jirayow, mahad baannu kuu naqaynaa; maxaa
yeelay, waxaad qaadatay xooggaagii weynaa, oo wax baad
xukuntay. 18 Oo quruumihiina way cadhoodeen, oo waxaa
yimid cadhadaadii iyo wakhtigii kuwii dhintay la xukumi
lahaa iyo wakhtigii abaalgudkooda la siin lahaa nebiyada
addoommadaada ah iyo quduusiinta iyo kuwa magacaaga
ka cabsada, yaryar iyo waaweynba, oo la baabbi'in lahaa
kuwa dhulka baabbi'iya. 19 Markaasaa waxaa samada laga
furay macbudkii Ilaah; oo waxaa macbudkiisa gudihiisa
ka muuqday sanduuqii axdigiisa; markaasaa waxaa soo
dhacay hillaac, iyo codad, iyo onkod, iyo dhulgariir, iyo roob
dhagaxyaale oo weyn.

12 Markaasaa waxaa samada ka muuqatay calaamo
weyn, taas oo ahayd naag qorraxda huwan, oo
dayaxuna wuxuu ka hooseeyey cagaheeda, madaxana
waxaa u saarnaa taaj laba iyo toban xiddigood ah, 2 oo
uur bay lahayd; wayna qaylinaysay iyadoo foolanaysa oo
xanuunsanaysa oo doonaysa inay umusho. 3 Oo haddana
samada waxaa ka muuqatay calaamo kale; oo bal eeg
waxaa la arkay masduulaa weyn oo cas, oo wuxuu lahaa
toddoba madax iyo toban gees, oo madaxyadiisii waxaa u
saarnaa toddoba taaj. 4 Oo dabadiisiina waxay soo jiidday
xiddigihii samada saddex meelood oo meel, oo waxay ku
soo tuurtay dhulka; markaasaa masduulaagii wuxuu is-hor
taagay naagtii ku dhowayd inay umusho, si uu ilmaha uga
liqo markay umusho. 5 Oo waxay umushay ilmo lab; kaas oo
loo xugmay inuu quruumaha oo dhan ul bir ah ku xukumo;
oo ilmaheediina waxaa kor loogu qaaday xagga Ilaah iyo
carshigiisa. 6 Oo naagtiina waxay u carartay xagga cidlada,
halkaasoo Ilaah iyada uga diyaariyey meel lagu quudiyo kun
iyo laba boqol iyo lixdan maalmood. 7 Markaasaa samada
waxaa ka dhacay dagaal, oo Mikaa'iil iyo malaa'igihiisii waxay
u soo baxeen inay la diriraan masduulaagii; oo masduulaagii
iyo malaa'igihiisiina way la dirireen; 8 kamana ay adkaan,
meeshoodiina mar dambe samada lagama helin. 9 Oo
masduulaagii weynaa oo ahaa maskii duqa ahaa hoos baa
loo soo tuuray, kaasoo la yidhaahdo Ibliis iyo Shayddaan,
kii dunida oo dhan khiyaaneeyey. Waxaa isaga lagu soo
tuuray dhulka, oo malaa'igihiisiina hoos baa loola soo tuuray
isaga. 10 Oo haddana waxaan samada ka maqlay cod weyn
oo leh, Haatan waxaa yimid badbaadadii, iyo xooggii, iyo
boqortooyadii Ilaaheenna, iyo amarkii Masiixiisa; maxaa
yeelay, kii walaalaheen dacweyn jiray hoos baa loo tuuray,
kaasoo iyaga ku dacweyn jiray Ilaaheenna hortiisa habeen
iyo maalinba. 11 Oo waxay isagii kaga adkaadeen dhiiggii
Wanka iyo eraygii markhaatifuriddooda; oo iyagu naftoodii
kalama ay lexejeclaabin xataa dhimasho. 12 Haddaba
samooyinka iyo kuwa dhex degganow, reyreeya. Waxaase
hoogay badda iyo dhulka, maxaa yeelay, waxaa idiin soo
degay Ibliiskii, oo aad u cadhaysan, oo weliba garanaya in
wakhtigu ku yar yahay. 13 Oo masduulaagiina markuu arkay

in hoos loogu tuuray xagga dhulka ayuu wuxuu silciyey
naagtii ilmaha lab dhashay. 14 Oo waxaa naagtii la siiyey
laba baal oo gorgor weyn si ay uga duusho maskii ilaa
meesheedii cidlada ku tiil, halkaasoo iyada lagu quudiyo
wakhti, iyo wakhtiyo, iyo wakhti badhkiis. 15 Oo maskiina
wuxuu afkiisa ka tufay oo naagtii ka daba tuuray biyo ah sidii
webi, si uu durdurku u qaado. 16 Markaasaa dhulku naagtii
caawiyey, oo afka kala qaaday, oo wuxuu liqay webigii
masduulaagu afkiisa ka soo tuuray. 17 Oo masduulaagii
aad buu ugu sii cadhooday naagtii, oo wuxuu u soo kacay
inuu la diriro farcankeedii kale oo hadhay oo amarrada Ilaah
xajiyo oo Ciise u markhaati furo.

13 Oo wuxuu isku dul taagay cammuuddii badda.
Kolkaasaan arkay bahal badda ka soo baxaya, oo
wuxuu lahaa toban gees iyo toddoba madax, oo geesihiisiina
waxaa u saarnaa toban taaj, oo madaxyadiisiina waxaa
ugu qornaa magacyo cay ah. 2 Oo bahalkii aan arkay
wuxuu u ekaa shabeel, oo cagihiisuna waxay u ekaayeen
cago orso, afkiisuna wuxuu u ekaa af libaax; markaasaa
masduulaagii wuxuu isaga siiyey xooggiisii iyo carshigiisii
iyo amar weyn. 3 Oo markaasaan arkay madaxyadiisii
midkood oo u eg mid la gowracay; oo nabarkii uu u dhintay
wuu bogsaday; oo dunida oo dhammuna waxay la yaabtay
bahalkii; 4 markaasay masduulaagii caabudeen, maxaa
yeelay, wuxuu amarkiisii siiyey bahalkii; iyaguna waxay
caabudeen bahalkii, waxayna yidhaahdeen, Bal yaa bahalka
la mid ah? Oo bal yaa awooda inuu la diriro? 5 Markaasaa
waxaa isagii la siiyey af ku hadlaya waxyaalo waaweyn iyo
cay; oo haddana waxaa la siiyey amar uu ku sii shaqeeyo
laba iyo afartan bilood. 6 Markaasuu afkiisii u furay inuu
Ilaah caayo, iyo inuu caayo magiciisa, iyo rugtiisa, iyo xataa
kuwa samada deggan. 7 Oo haddana waxaa isagii la siiyey
amar uu kula dagaallamo quduusiinta oo uu kaga adkaado;
oo haddana waxaa la siiyey amar uu ku xukumo qabiil
kasta iyo dad kasta iyo af kasta iyo quruun kasta. 8 Oo
waxaa isaga caabudi doona inta dhulka deggan oo dhan
oo aan magacooda lagu qorin kitaabka nolosha oo Wanka
la gowracay waagii dunida la aasaasay. 9 Hadduu jiro nin
dheg lahu ha maqlo. 10 Haddii nin dad xabbiso, isagana
waa la xabbisi doonaa; oo haddii nin seef wax ku dilo, waa
in isagana seef lagu dilo. Waa kaa samirka iyo rumaysadka
quduusiintu. 11 Oo haddana waxaan arkay bahal kale oo
dhulka ka soo baxaya, oo wuxuu lahaa laba gees oo u eg
wan geesihiis, oo wuxuu u hadlayay sidii masduulaa oo
kale. 12 Oo wuxuu bahalkii kowaad hortiisa wax kaga qabtay
amarkiisii oo dhan. Oo dunida iyo kuwa degganba wuxuu ka
dhigay inay caabudaan bahalkii kowaad oo nabarkii uu u
dhintay bogsaday. 13 Oo wuxuu sameeyey calaamooyin
waaweyn, wuuna karay xataa inuu dab samada ka soo
dejiyo oo dhulka ku soo tuuro dadka hortiisa. 14 Oo kuwa
dhulka deggan wuxuu ku khiyaaneeyey calaamooyinkii isaga
loo siiyey inuu ku sameeyo bahalkii hortiisa; isagoo kuwa
dhulka deggan ku leh, Waa inaad sanam u samaysaan
bahalka seefta nabarkeedii ku yaal ee soo noolaaday. 15
Oo haddana waxaa isagii la siiyey xoog uu neef ku geliyo
sanamkii bahalka, in sanamkii bahalku hadlo oo uu ka dhigo
in la dilo in alla intii aan caabudin sanamkii bahalka. 16 Oo
haddana wuxuu ka dhigay in kulli, yar iyo weyn, iyo taajir iyo
faqiir, iyo xor iyo addoonba sumad lagaga dhigo gacanta
midigta ama wejiga; 17 iyo inaanu ninna awoodin inuu wax
iibiyo ama iibsado, kii sumadda leh mooyaane, taasoo ah
magaca bahalka ama nambarka magiciisa. 18 Xigmaddii
waa tan. Kii waxgarasho lahu ha tiriyo nambarka bahalka;
waayo, waxa weeye nin nambarkiis, oo nambarkiisuna waxa
weeye lix boqol iyo lix iyo lixdan.

14 Oo bal eeg, waxaan arkay Wankii oo ku dul taagan
Buur Siyoon, oo waxaa isaga la jiray boqol iyo afar
iyo afartan kun oo qof, oo waxaa wejiga ugu qornaa isaga
magiciisa iyo magaca aabbihiis. 2 Markaasaan samada
ka maqlay cod u eg biyo badan codkood iyo onkod weyn
codkiis; oo codkii aan maqlayna wuxuu u ekaa kataaraley
ka dhawaajinaysa kataaradahooda; 3 markaasay carshiga
hortiisa iyo afartii xayawaan iyo odayaasha hortoodii waxay
ku gabyeen gabay cusub; oo gabaygaas ninna ma baran
karin, boqol iyo afar iyo afartanka kun oo dunida laga soo
iibsaday mooyaane. 4 Kuwanu waa kuwii aan naagaha ku
nijaasoobin; waayo, iyagu waa daahir; kuwanu waa kuwa
Wanka u raaca meel alla meeshuu tagoba. Kuwan waxaa
laga soo iibsaday dadka inay midhaha ugu horreeya u
noqdaan Ilaah iyo Wankaba. 5 Oo afkooda innaba been
lagama helin, iinna ma leh. 6 Oo haddana waxaan arkay
malaa'ig kale oo samada dhex duulaysa iyadoo wadata
injiil daa'imis ah inay u naadiso kuwa dhulka deggan iyo
quruun kasta iyo qabiil kasta iyo af kasta iyo dad kasta;
(aiōnios g166) 7 iyadoo cod weyn ku leh, Ilaah ka cabsada, oo
isaga ammaana, waayo, saacaddii xukunkiisu way timid. Oo
caabuda kii sameeyey samada iyo dhulka iyo badda iyo
ilaha biyaha ah. 8 Oo malaa'ig kale oo labaad ayaa soo
raacday, oo waxay lahayd, Waxaa dhacday oo dhacday
Baabuloontii weynayd, taasoo quruumaha oo dhan ka
waraabisay khamrigii cadhada sinadeeda. 9 Oo haddana
waxaa soo raacday malaa'ig kale oo saddexaad, iyadoo cod

weyn ku leh, Haddii nin caabudo bahalka iyo sanamkiisa,
ama uu aqbalo sumad in lagaga dhigo wejiga ama gacanta,
10 isna wuxuu ka cabbi doonaa khamriga cadhada Ilaah oo
lagu shubay koobka cadhadiisa isagoo aan badhxanayn; oo
waxaa isaga lagu silcin doonaa dab iyo baaruud malaa'igaha
quduuska ah hortooda iyo Wanka hortiisa. 11 Oo qiiqa
caddibaaddooda kor buu u baxayaa weligiis iyo weligiis,
oo kuwa caabuda bahalka iyo sanamkiisa, iyo ku alla kii
aqbala sumadda magiciisa nasasho heli maayaan habeen
iyo maalin toona. **(aiōn g165)** 12 Waa kaa samirkii quduusiinta,
kuwaas oo ah kuwa xajiya amarrada Ilaah iyo iimaanka
Ciise. 13 Oo haddana waxaan samada ka maqlay cod igu
leh, Qor, Waxaa barakaysan kuwa hadda ka dib dhimanaya
iyagoo Rabbiga rumaysan. Ruuxii wuxuu leeyahay, Haah,
iyagu waa inay ka nastaan hawshoodii, waayo, waxaa iyaga
la socda shuqulladoodii. 14 Oo bal eeg, haddana waxaan
arkay daruur cad, oo waxaan daruurta dusheeda ku arkay
mid fadhiya oo u eg bini aadan, oo waxaa madaxa u saarnaa
taaj dahab ah, oo gacantana wuxuu ku haystay manjo af
badan. 15 Oo haddana malaa'ig kale ayaa waxay ka soo
baxday macbudkii, oo waxay cod weyn ugu dhawaaqday kii
daruurta ku fadhiyey, iyadoo leh, Manjadaada soo dir oo
beerta goo; waayo, saacaddii beergooysku way timid; maxaa
yeelay, midhihii dhulka oo la gooyn lahaa way bislaadeen.
16 Markaasaa kii daruurta ku fadhiyey wuxuu manjadiisii ku
soo tuuray dhulka, oo midhihii dhulkiina waa la gooyay. 17
Oo haddana malaa'ig kale ayaa waxay ka baxday macbudka
samada ku yaal, oo iyana waxay haysatay manjo af badan.
18 Oo haddana malaa'ig kale oo dabka xukunta ayaa waxay
ka soo baxday meeshii allabariga; oo waxay cod weyn ugu
dhawaaqday tii manjada afka badan haysatay iyadoo ku
leh, Manjadaada afka badan soo dir, oo waxaad ururisaa
canabka dhulka rucubyadiisa; maxaa yeelay, canabkii waa
bislaaday. 19 Markaasaa malaa'igtii waxay manjadeedii
ku soo tuurtay dhulka, oo waxay soo ururisay canabka
dhulka, oo waxay ku tuurtay macsaraddii canabka oo weyn
oo cadhada Ilaah. 20 Oo canabkiina waxaa lagu tuntay
magaalada dibaddeeda, oo waxaa macsaraddii ka soo baxay
dhiig, wuxuuna gaadhay tan iyo fardaha xakamahooda, ilaa
kun iyo lix boqol oo istaadiyon.

**15** Oo haddana waxaan samada ku arkay calaamo kale
oo weyn oo cajaa'ib leh, waxayna ahayd toddoba
malaa'igood oo haysta toddoba belaayo, oo ahaa kuwii ugu
dambeeyey, waayo, waxaa iyaga ku dhex dhammaatay
cadhadii Ilaah. 2 Markaasaan arkay wax u eg bad muraayad
ah oo dab ku dhex qasan yahay iyo kuwii iyagoo guulaysan
ka yimid xaggii bahalkii iyo xaggii sanamkiisii iyo xaggii
nambarkii magiciisa, oo dul taagan baddii muraayadda
ahayd iyagoo haysta kataaradihii Ilaah. 3 Oo iyana waxay
ku gabyeen addoonkii Ilaah oo Muuse ahaa gabaygiisii
iyo gabaygii Wanka iyagoo leh, Rabbiyow Ilaaha Qaadirka
ahow, shuqulladaadu way weyn yihiin, oo yaab bay leeyihiin.
Boqorka quruumahow, jidadkaagu waa xaq oo waa run. 4
Rabbiyow, bal ayaan kaa cabsan doonin oo aan magacaaga
ammaani doonin? Waayo, adiga keligaa ayaa quduus
ah; maxaa yeelay, quruumaha oo dhammu way iman oo
hortaada ayay ku sujuudi doonaan; waayo, falimahaagii
xaqa ahaa waa la muujiyey. 5 Oo waxyaalahaas dabadood
waxaan arkay macbudkii taambuugga markhaatifuridda
oo samada ku jira oo la furay. 6 Markaasaa macbudkii
waxaa ka soo baxay toddobadii malaa'igood oo haystay
toddobada belaayo, oo waxay qabeen dhar daahir ah oo
dhalaalaya, oo laabtana waxaa ugu xidhnaa suuman dahab
ah. 7 Oo afartii xayawaan midkood ayaa wuxuu toddobadii
malaa'igood siiyey toddoba fijaan oo dahab ah oo ay ka
buuxdo cadhadii Ilaaha weligiis iyo weligiisba nool. **(aiōn g165)**
8 Markaasaa macbudkii waxaa ka buuxsamay qiiq ka yimid
xagga ammaanta Ilaah iyo xagga xooggiisa; oo ninna ma
uu geli karin macbudkii ilamaa la dhammeeyo toddobadii
belaayo oo ay toddobadii malaa'igood haysteen.

**16** Markaasaan maqlay cod weyn oo macbudkii ka
yeedhaya, oo toddobadii malaa'igood ku leh, Taga,
oo toddobada fijaan oo cadhada Ilaah ku jirto dhulka ku
shuba. 2 Markaasaa waxaa tagtay middii kowaad, oo waxay
fijaankeedii ku shubtay dhulka, oo wuxuu dadkii sumaddii
bahalka lahaa oo caabuday sanamkiisii u noqday boog xun
oo halis ah. 3 Oo tii labaadna fijaankeedii waxay ku shubtay
badda; markaasay baddii noqotay sidii nin dhintay dhiiggiis
oo kale, oo waxyaalihii ku noolaa oo dhammu way wada
dhinteen. 4 Oo tii saddexaadna waxay fijaankeedii ku shubtay
webiyaashii iyo ilihii biyaha ahaa; oo waxay noqdeen dhiig.
5 Kolkaasaan maqlay malaa'igtii biyaha oo leh, kan jira oo
jirayow, adigu xaq baad tahay, adiga Quduuska ahow, maxaa
yeelay, sidaasaad wax u xukuntay; 6 waayo, iyagu waxay
daadiyeen dhiiggii quduusiintii iyo nebiyadii, oo adiguna
waxaad ka waraabisay dhiig; waayo, way istaahilaan. 7 Oo
haddana waxaan maqlay meeshii allabariga oo leh, Haah,
Rabbiyow Ilaaha Qaadirka ahow, waxaa run iyo xaq ah
xukummadaada. 8 Oo tii afraadna waxay fijaankeedii ku
shubtay qorraxda; oo waxaa qorraxdii la siiyey amar ay
dadka ku gubto. 9 Markaasaa dadkii waxaa lagu gubay
kulayl weyn, oo waxay caayeen magicii Ilaaha belaayooyinka

u taliya, oo ma ay toobadkeenin inay isaga ammaanaan. 10
Oo tii shanaadna waxay fijaankeedii ku shubtay carshigii
bahalka; boqortooyadiisiina way madoobaatay, oo iyana
xanuun aawadiis ayay carrabkoodii la ruugeen, 11 oo
xanuunkoodii iyo nabrahoodii aawadood waxay caayeen
Ilaaha samada, oo shuqulladoodiina kama ay toobadkeenin.
12 Oo tii lixaadna waxay fijaankeedii ku shubtay webiga
weyn oo Yufraad; oo biyihiisiina way engegeen, in jidka
loo diyaariyo boqorrada ka imanaya qorrax ka soo bax.
13 Markaasaan arkay saddex jinni oo nijaas ah oo ka soo
baxaya masduulaagii afkiisii, iyo bahalka afkiisii, iyo nebigii
beenta ahaa afkiisii, oo waxay u ekaayeen rahyo; 14 waayo,
waxay ahaayeen ruuxyo jinniyo oo calaamooyin samaynaya,
kuwaas oo u taga boqorrada dunida oo dhan inay u soo
ururiyaan dagaalka maalinta weyn oo Ilaaha Qaadirka ah.
15 (Oo bal eeg, Anigu waxaan u imanayaa sida tuug oo
kale. Haddaba waxaa barakaysan kii soo jeeda oo dharkiisa
dhawra sii uusan qaawanaan ugu socon oo aan cawradiisa
loo arag.) 16 Oo iyana waxay boqorradii ku soo ururiyeen
meesha afka Cibraaniga lagu yidhaahdo Armageddoon. 17
Oo tii toddobaadna waxay fijaankeedii ku shubtay hawada;
markaasaa macbudkii waxaa ka soo baxay cod weyn oo ka
yimid carshiga xaggiisa, wuxuuna lahaa, Way dhammaatay.
18 Markaasaa waxaa dhacay hillaac iyo codad iyo onkod; oo
waxaa dhacay dhulgariir weyn oo aan weligiis isagoo kale
la arag intii dad dhulka joogay, oo wuxuu ahaa dhulgariir
aad u weyn oo aad u xoog badan. 19 Oo magaaladii
weynaydna waxaa loo kala qaybiyey saddex meelood,
oo magaalooyinkii quruumuhuna way wada dumeen; oo
Baabuloontii weynaydna waxaa laga xusuustay Ilaah hortiisa
in iyada la siiyo koobkii khamriga xanaaqa cadhadiisa. 20
Oo gasiirad kastaaba way carartay, buurihiina lama helin.
21 Oo waxaa samada ka soo daatay oo dadka ku soo dul
daatay roob dhagaxyaale, oo dhagax kastaba miisaankiisu
le'eg yahay talanti; markaasaa dadkii waxay Ilaah u caayeen
belaayadii roob dhagaxyaalaha aawadeed, maxaa yeelay,
belaayadiisu aad bay u weynayd.

**17** Markaasaa waxaa timid toddobadii malaa'igood oo
toddobada fijaan haystay middood, oo way ila hadashay,
waxayna igu tidhi, Kaalay halkan, waxaan ku tusi doonaa
xukunka dhillada weyn oo biyaha badan ku dul fadhida, 2
taasoo boqorrada dunidu ay ka sinaysteen, oo kuwa dunida
degganuna ay khamrigii sinadeeda ku sakhraameen. 3
Markaasay waxay igu qaadday Ruuxa, oo waxay i geeysay
cidlada; markaasaan arkay naag fuushan bahal guduudan oo
ay ka buuxaan magacyo cay ahu, oo wuxuu lahaa toddoba
madax iyo toban gees. 4 Oo naagtuna waxay qabtay dhar
midabkiisu yahay casaan iyo guduud, oo waxaa kaloo ay
ku sharraxnayd dahab iyo dhagaxyo qaali ah iyo luul, oo
waxay gacanta ku haysatay koob dahab ah oo waxyaalihii
karaahiyada ahaa ka buuxaan, kuwaas oo ahaa waxyaalihii
nijaasta ahaa oo sinadeeda, 5 oo waxaa wejiga ugu qornaa
magac ah qarsoodi, oo ah Baabuloonta weyn ee hooyada u
ah dhillooyinka iyo waxyaalaha karaahiyada ah oo dunida.
6 Markaasaan arkay naagtii oo ku sakhraantay dhiiggii
quduusiinta iyo dhiiggii kuwii Ciise u markhaati furay. Oo
markaan iyadii arkay ayaan aad ula yaabay. 7 Markaasaa
malaa'igtii waxay igu tidhi, War, maxaad u yaabtay? Waxaan
kuu sheegi doonaa qarsoodiga naagta iyo bahalka iyada sida
oo leh toddobada madax iyo tobanka gees. 8 Bahalkii aad
aragtay wuu jiray, haddase ma jiro; oo wuxuu dhowaan ka
soo bixi doonaa yamayska, oo wuxuu tegi doonaa halaag. Oo
kuwa dhulka jooga oo aan magacooda lagu qorin kitaabka
nolosha waagii dunida la aasaasay, markay bahalka arkaan
waxay la yaabi doonaan siduu markii hore u jiray, oo uusan
haatan u jirin, oo uu hadda ka dib u jiri doono. **(Abyssos g12)** 9
Waa kan maanka xigmadda lihi. Toddobada madax waa
toddoba buurood oo ay naagtu ku fadhiisato; oo iyagu waxa
weeyaan toddoba boqor; 10 shantood way dhaceen, midna
wuu joogaa, midkii kalena weli ma iman; oo markuu yimaado,
in yar buu sii jiri doonaa. 11 Oo bahalkii markii hore jiray oo
aan haatan jirin, isaga qudhiisuna waa mid siddeedaad oo
toddobaduu ka mid yahay; oo wuxuu tegi doonaa halaag. 12
Oo tobankii gees oo aad aragtay waa toban boqor, oo aan
weli helin boqortooyo; laakiinse intii saacad ah waxay amar
la heleen bahalka sida boqorro oo kale. 13 Kuwanu waa isku
maan, oo iyagu xooggooda iyo amarkooda waxay siiyeen
bahalka. 14 Kuwaasu waxay la diriri doonaan Wanka, oo
Wankuna wuu ka adkaan doonaa, maxaa yeelay, isagu waa
Sayidka sayidyada iyo Boqorka boqorrada; oo haddana
kuwa isaga la jira waa kuwa loo yeedhay, oo la doortay,
oo aaminiinta ah. 15 Markaasay waxay igu tidhi, Biyihii
aad aragtay oo ay dhilladu ku dul fadhiday waxa weeyaan
dadad iyo maqluuqyo iyo quruumo iyo afaf. 16 Oo tobankii
gees oo aad aragtay iyo bahalkii waxay nebcaan doonaan
dhillada, oo iyada way bi'in doonaan oo qaawin doonaan,
oo hilibkeedana way cuni doonaan, oo kulligeedna waxay
ku gubi doonaan dab. 17 Waayo, Ilaah wuxuu qalbigooda
geliyey inay yeelaan fikirkiisa, oo ay isku maan ahaadaan,
oo ay boqortooyadooda bahalka siiyaan ilamaa erayada
Ilaah ay kaamil noqdaan. 18 Oo naagtii aad aragtayna waxa
weeye magaalada weyn oo u talisa boqorrada dhulka.

18 Waxyaalahaas ka dib waxaan arkay malaa'ig kale oo
samada ka soo degaysa, waxayna lahayd amar weyn;
oo dhulkuna wuxuu la iftiimay dhalaalkeedii. 2 Markaasay
ku dhawaaqday cod xoog weyn, oo waxay tidhi, Waxaa
dhacday oo dhacday Baabuloontii weynayd, oo waxay
noqotay hoygii shaydaanyada, iyo rugtii jinni kasta oo nijaas
ah, iyo rugtii shimbir kasta oo nijaas ah oo la neceb yahay. 3
Waayo, quruumihii oo dhammu waxay ku dhaceen khamrigii
cadhada sinadeeda; oo boqorradii dhulka oo dhammuna
iyaday ka sinaysteen, oo baayacmushtariyadii dunidu waxay
ku taajireen xooggii barwaaqadeeda. 4 Oo haddana waxaan
maqlay cod kale oo samada ka dhawaaqaya oo leh,
Dadkaygiiyow, iyada ka soo baxa, yeydnan dembiyadeeda la
qaybsane, oo aydnaan belaayooyinkeeda heline; 5 waayo,
dembiyadeedii waxay gaadheen xataa samada, oo Ilaahna
wuu xusuustay xaqdarradeedii: 6 Iyada wax u siiya sidii ay
wax idiin siisay oo kale, oo weliba u sii labanlaaba sida
shuqulkeedu ahaa; oo koobkii ay wax idiinku qastay, wax
ugu qasa labanlaab. 7 Oo intii ay isfaanisay iyo intii ay
raaxaysatay oo kale, waxaad iyada siisaan caddibaad iyo
murug; waayo, iyadu waxay qalbigeeda iska tidhaahdaa,
Anigoo boqorad ah ayaan iska fadhiyaa, oo carmalna ma
ihi, oo sinaba murug u arki maayo. 8 Sidaas daraaddeed
maalin keliya waxaa iyada u iman doona belaayooyinkeeda,
kuwaas oo ah dhimasho iyo murug iyo abaar; oo iyada
kulligeed waxaa lagu gubi doonaa dab, waayo, Rabbiga
Ilaaha ah oo iyada xukumay waa xoog badan yahay. 9 Oo
boqorradii dunida oo iyada ka sinaystay oo la raaxaystay
ayaa u ooyi doona oo u barooran doona markii ay arkaan
qiiqa gubashadeeda, 10 iyagoo meel fog la taagan cabsida
caddibaaddeeda, oo waxay odhan doonaan, Waxaa hoogtay
oo hoogtay magaalada weyn oo Baabuloon, taasoo ah
magaalada xoogga badan! Waayo, xukunkaagu saacad
keliya buu ku yimid. 11 Oo baayacmushtariyadii duniduna
iyaday u ooyaan oo u baroortaan, waayo, ninna hadda ka
dib iibsan maayo shixnaddoodii; 12 shixnaddaas oo ah
dahab, iyo lacag, iyo dhagaxyo qaali ah, iyo luul, iyo dhar
wanaagsan, iyo dhar guduudan, iyo xariir, iyo dhar cas, iyo
alwaax kasta oo tu'inos ah, iyo weel kasta oo foolmaroodi
laga sameeyey, iyo weel kasta oo alwaax qaali ah laga
sameeyey, iyo kuwa laga sameeyey naxaas, iyo bir, iyo
marmar, 13 iyo qorfe, iyo xawaash, iyo uunsi, iyo barafuun,
iyo foox, iyo khamri, iyo saliid, iyo bur wanaagsan, iyo
sarreen, iyo lo', iyo ido, iyo fardo, iyo gaadhifardood, iyo
addoommo, iyo nafaha dadka. 14 Oo midhihii naftaadu
ay damacday way kaa tageen, oo waxyaalihii fiicanaa oo
dhalaalayay oo dhammuna way kaa baabbe'een, oo mar
dambena lama heli doono. 15 Oo baayacmushtariyadii
alaabtaas lahaa oo iyada taajir ku noqday, waxay meel
fog la istaagi doonaan cabsida caddibaaddeeda iyagoo
ooyaya oo barooranaya; 16 oo waxay odhan doonaan,
Waxaa hoogtay oo hoogtay magaalada weyn, tii qabi jirtay
dhar wanaagsan, iyo dhar guduudan, iyo dhar cas, oo ku
sharraxnaan jirtay dahab, iyo dhagaxyo qaali ah, iyo luul.
17 Waayo, maalka saas u badanu saacad keliya buu ku
baabba'ay. Oo waxaa meel fog istaagay naakhude kasta,
iyo mid kasta oo dhoofa, iyo ragga baxriyiinta ah, iyo in
alla inta badda ka faa'iidaysata, 18 oo way qayliyeen markii
ay arkeen qiiqii gubashadeeda, waxayna yidhaahdeen,
Bal magaaladee baa la mid ah magaalada weyn? 19 Oo
iyana intay madaxa boodh ku shubteen ayay qayliyeen
oo ooyeen oo baroorteen, oo waxay yidhaahdeen, Waxaa
hoogtay oo hoogtay magaaladii weynayd oo kulli inta
badda doonniyaha ku lahu ay dhexdeeda kaga taajireen
maalkeedii, waayo, iyadii saacad keliya bay baabba'day.
20 Haddaba iyada ku farxa, samaday, iyo quduusiintay, iyo
rasuulladow, iyo nebiyadow, waayo, Ilaah xukunkiinnii iyaduu
ku xukumay. 21 Markaasaa malaa'ig xoog weynu waxay
kor u qaadatay dhagax u eg dhagaxshiid weyn, oo waxay
ku dhex tuurtay badda, oo waxay tidhi, Magaalada weyn
oo Baabuloon sidaas oo kale xoog baa hoos loogu tuuri
doonaa, oo hadda ka dibna lama heli doono. 22 Oo mar
dambe dhexdaada lagama maqli doono codka kataaralayda,
iyo muusikalayda, iyo kuwa biibiilaha ka dhawaajiya, iyo
kuwa turumbada ka dhawaajiya; oo dhexdaada innaba
lagama heli doono sancalow sanco kasta ha qabtee; oo
sanqadha dhagaxshiidkana dhexdaada innaba lagama maqli
doono mar dambe; 23 oo laambad iftiinkeedna mar dambe
dhexdaada innaba kama ifi doono, oo codkii arooska iyo
aroosaddana dhexdaada innaba mar dambe lagama maqli
doono, waayo, baayacmushtariyadaadu waxay ahaayeen
amiirradii dhulka, maxaa yeelay, saaxirnimadaadii ayaa
quruumaha oo dhan lagu khiyaaneeyey. 24 Oo dhexdeeda
waxaa laga helay dhiiggii nebiyadii iyo quduusiintii iyo dhiiggii
kuwii dhulka lagu dilay oo dhan.

19 Oo waxyaalahaas ka dib waxaan maqlay wax u eg
cod weyn oo maqluuq badan oo samada ku jira, oo
waxay lahaayeen, Halleeluuya; badbaado iyo ammaan iyo
xoog waxaa leh Ilaahayaga; 2 waayo, waxaa run iyo xaq ah
xukummadiisa, maxaa yeelay, isagu wuu xukumay dhilladii
weynayd ee dhulka ku hallaysay sinadeedii; oo dhiiggii
addoommadiisiina gacanteeda wuu ka aaray. 3 Oo haddana
mar labaad ayay yidhaahdeen, Halleeluuya. Oo qiiqeeduna

kor buu u baxaa weligiis iyo weligiis. **(aiōn g165)** **4** Markaasaa
afar iyo labaatankii oday iyo afartii xayawaan ayaa sujuuday,
oo waxay caabudeen Ilaaha carshiga ku fadhiya iyagoo
leh, Aamiin, Halleeluuya. **5** Markaasaa cod baa ka soo
baxay carshigii, oo wuxuu yidhi, Ilaaheenna ammaana,
addoommadiisa oo dhammow, kuwiinna isaga ka cabsadow,
yar iyo weynba. **6** Oo haddana waxaan maqlay wax u
eg maqluuq badan codkood, iyo biyo badan codkood, iyo
onkod xoog weyn codkiis, oo waxay lahaayeen, Halleeluuya,
waayo, waxaa wax xukuma Rabbiga Ilaahayaga oo Qaadirka
ah. **7** Aynu rayrayno oo aad u faraxno, oo aynu ammaanno
isaga; waayo, arooskii Wanku wuu yimid, oo afadiisiina way
isdiyaarisay. **8** Oo waxaa iyadii lagu amray inay xidhato dhar
wanaagsan oo dhalaalaya oo daahir ah; waayo, dharka
wanaagsanu waxa weeye falimihii xaqa ahaa oo quduusiinta.
**9** Oo wuxuu igu yidhi, Waxaad qortaa, Waxaa barakaysan
kuwa loogu yeedhay arooska Wanka cashadiisa. Oo wuxuu
kaloo igu yidhi, Kuwanu waa erayadii Ilaah oo run ah. **10**
Inaan isaga caabudo aawadeed ayaan cagihiisa ugu hor
dhacay. Oo isna markaasuu wuxuu igu yidhi, Iska jir oo
saas ha yeelin. Anigu waxaan addoon la ahay adiga iyo
walaalahaaga haya markhaatifuridda Ciise. Ilaah u sujuud,
waayo, markhaatifuridda Ciise waa ruuxa wax sii sheegidda.
**11** Oo bal eeg, waxaan arkay samadii oo furantay, iyo faras
cad, oo kii fuushanaana waxaa la odhan jiray Aamin iyo Run;
oo isagu xaqnimuu wax ku xukumaa oo uu ku diriraa. **12** Oo
indhihiisuna waxay u ekaayeen ololka dabka, madaxiisana
waxaa u saarnaa taajaj badan; oo waxaa ugu qornaa magac
aanu ninna aqoon isaga mooyaane. **13** Oo isna wuxuu qabay
dhar dhiig lagu rusheeyey, magiciisana waxaa la odhan jiray
ereyga Ilaah. **14** Oo ciidammadii samada ku jirayna isagay
soo raaceen iyagoo fuushan fardo cadcad oo qaba dhar
wanaagsan oo cad oo daahir ah. **15** Oo afkiisana waxaa
ka soo baxday seef af badan inuu ku laayo quruumaha;
oo wuxuu iyaga ku xukumi doonaa ul bir ah, oo wuxuu ku
tumay macsaraddii canabka oo xanaaqii cadhada Ilaaha
Qaadirkaa. **16** Oo dharkiisa iyo bowdadiisana waxaa ugu
qornaa magac, kaas oo ah BOQORKA BOQORRADA, IYO
SAYIDKA SAYIDYADA. **17** Oo markaasaan arkay malaa'ig
qorraxda dhex taagan; oo intay cod weyn ku dhawaaqday
ayay waxay haadda samada dhex duusha oo dhan ku tidhi,
Kaalaya oo u soo urura cashada weyn oo Ilaah, **18** aad
idinku cunteene hilibka boqorrada, iyo hilibka kabtannada,
iyo hilibka ragga xoogga badan, iyo hilibka fardaha iyo
kuwa fuushan, iyo hilibka dadka oo dhan, xor iyo addoon,
iyo yar iyo weynba. **19** Oo markaasaan arkay bahalkii iyo
boqorradii dhulka iyo ciidammadoodii oo u soo wada ururay
inay la diriraan kii faraska fuushanaa iyo ciidankiisii. **20**
Markaasaa la qabtay bahalkii iyo nebigii beenta ahaa oo
calaamooyinka hortiisa ku samayn jiray, kuwaasoo uu ku
khiyaanayn jiray kuwii aqbalay sumaddii bahalka iyo kuwii
u sujuuday sanamkiisii, oo labadoodii iyagoo nool ayaa
waxaa lagu dhex tuuray baddii dabka ahayd, oo baaruuddu
ka ololaysay; **(Limnē Pyr g3041 g4442)** **21** oo intoodii kalena
waxaa lagu laayay kii faraska fuushanaa seeftiisii afkiisa ka
soo baxday; oo haaddii oo dhammu waxay ka dhergeen
hilibkoodii.


**20** Oo markaasaan arkay malaa'ig samada ka degaysa,
oo waxay gacanta ku haysatay furihii yamayska iyo
silsilad weyn. **(Abyssos g12)** **2** Oo markaasay qabsatay
masduulaagii ahaa maska duqa ah, kaasoo ah Ibliiska iyo
Shayddaanka, oo intii kun sannadood ah ayay xidhay, **3** oo
waxay ku ridday yamayskii, markaasay xidhay oo shaabad
ku awday inaanu quruumaha mar dambe khiyaanayn ilamaa
kunka sannadood ay dhammaadaan; oo taas ka dib waa
in isaga la furo wakhti yar. **(Abyssos g12)** **4** Oo markaasaan
arkay carshiyo, oo waxaa kuwa ku fadhiyey la siiyey amar
ay ku xukumaan; oo haddana waxaan arkay nafihii kuwii
madaxa looga jaray markhaatigii ay Ciise u fureen aawadiis,
iyo eraygii Ilaah aawadiis, iyo kuwii aan caabudin bahalkii
iyo sanamkiisa toona, oo aan aqbalin in sumaddii lagaga
dhigo wejigooda iyo gacantooda; way soo noolaadeen
oo kun sannadood ayay Masiix wax la xukumeen. **5** Oo
dadkii dhintay intoodii kalena sooma ay noolaan ilamaa ay
kunkii sannadood dhammaadeen. Kanu waa sarakicidda
kowaad. **6** Waxaa barakaysan oo quduus ah kii ka qayb gala
sarakicidda kowaad; kuwaas dhimashada labaadi amar kuma
laha, laakiinse waxay wadaaddo u ahaan doonaan Ilaah
iyo Masiixa, oo waxay isaga wax la xukumi doonaan kun
sannadood. **7** Oo markii kunkii sannadood ay dhammaadaan
ayaa Shayddaanka laga furi doonaa xabsigii lagu xabbisay,
**8** oo wuxuu u soo bixi doonaa inuu khiyaaneeyo quruumaha
deggan dhulka afartiisa gees, kuwaas oo ah Juuj iyo Maajuuj
inuu iyaga u soo ururiyo dagaalka; oo tiradooduna waa sida
ciidda badda. **9** Oo waxay ku soo kor baxeen ballaadhka
dhulka, oo waxay hareereeyeen kaambadii quduusiinta
iyo magaaladii la jeclaa; markaasaa waxaa samada ka
soo degay dab, wuuna laastay iyagii. **10** Oo Ibliiskii iyaga
khiyaanayn jirayna waxaa lagu dhex tuuray baddii dabka iyo
baaruudda ahayd, halkaas oo ay ku jiraan bahalkii iyo nebigii
beenta ahaa, oo iyaga waxaa la cadaabi doonaa habeen
iyo maalinba weligood iyo weligoodba. **(aiōn g165, Limnē Pyr
g3041 g4442)** **11** Oo markaasaan arkay carshi weyn oo cad,

iyo kii ku fadhiyey, oo wejigiisa dhulkii iyo samadii ay ka
carareen, oo iyagiina meel looma helin. **12** Oo markaasaan
arkay kuwii dhintay, yar iyo weynba, iyagoo taagan carshiga
hortiisii, markaasaa waxaa la furay kitaabbadii; oo haddana
waxaa la furay kitaab kale oo ah kii nolosha; oo kuwii
dhintay waxaa lagu xukumay waxyaalihii kitaabbadii ku
qornaa, sidii ay shuqulladoodii ahaayeen. **13** Markaasaa
baddii waxay sii daysay kuwii dhintay oo dhexdeedii ku jiray;
oo dhimashadii iyo Haadeesna waxay sii daayeen kuwii
dhintay oo dhexdoodii ku jiray; markaasaa iyagii waxaa
laga xukumay nin walba sidii shuqulladiisu ahaayeen. **(Hadēs
g86)** **14** Oo dhimashadii iyo Haadeesba waxaa lagu tuuray
baddii dabka ahayd. Oo taasu waa dhimashadii labaad oo
ah badda dabka ah. **(Hadēs g86, Limnē Pyr g3041 g4442)** **15** Oo ku
alla kii aan kitaabkii nolosha laga helin isagoo ku qoran,
waxaa lagu tuuray baddii dabka ahayd. **(Limnē Pyr g3041 g4442)**

**21** Oo waxaan arkay samo cusub iyo dhul cusub; waayo,
samadii hore iyo dhulkii hore way dhammaadeen; oo
baddiina mar dambe ma ay jirin. **2** Oo haddana waxaan arkay
magaalada quduuska ah, taasoo ah Yeruusaalem cusub oo
samada ka soo degaysa xagga Ilaah, iyadoo loo diyaariyey
sidii aroosad ninkeedii loo sharraxay. **3** Markaasaan maqlay
cod weyn oo carshiga ka yeedhaya oo leh, Bal eeg, rugta
Ilaah waxay la jirtaa dadka, oo isna wuxuu la degganaan
doonaa iyaga, oo iyana waxay ahaan doonaan dadkiisa, oo
Ilaah qudhiisuna wuxuu la jiri doonaa iyaga, oo wuxuu ahaan
doonaa Ilaahood; **4** oo isna indhahooda ilmo kastuu ka tirtiri
doonaa, oo dhimashona mar dambe ma jiri doonto, oo mar
dambena ma jiri doonaan murug iyo oohin iyo xanuun toona,
waayo, waxyaalihii hore way dhammaadeen. **5** Markaasaa
kii carshiga ku fadhiyey wuxuu yidhi, Bal eeg, wax kastaba
cusayb baan ka dhigayaa. Oo wuxuu igu yidhi, Qor, waayo,
erayadanu waa aamin iyo run. **6** Oo wuxuu igu yidhi, Iyagu
way ahaadeen. Anigu waxaan ahay Alfa iyo Oomeega,
iyo bilowgii iyo dhammaadka. Oo kii harraadsan waxaan
hadiyad ahaan uga waraabin doonaa isha biyaha nolosha.
**7** Oo kii guulaystaa wuxuu dhaxli doonaa waxyaalahan,
oo anna waxaan isaga u ahaan doonaa Ilaah, isna wuxuu
ii ahaan doonaa wiil. **8** Laakiinse kuwa fulayaasha ah,
iyo kuwa aan rumaysan, iyo kuwa karaahiyada ah, iyo
gacankudhiiglayaasha, iyo kuwa sinaysta, iyo saaxiriinta, iyo
kuwa sanamyada caabuda, iyo beenlowyada oo dhan waxaa
qaybtoodu ku jiri doontaa badda ay dabka iyo baaruuddu
ka ololayaan, oo taasuna waa dhimashada labaad. **(Limnē
Pyr g3041 g4442)** **9** Markaasaa waxaa yimid mid ka mid ah
toddobadii malaa'igood oo haystay toddobadii fijaan oo ay
ka buuxeen toddobadii belaayo ee ugu dambeeyey; oo iyana
way ila hadashay, oo waxay igu tidhi, Bal kaalay halkan oo
waxaan ku tusayaa aroosadda oo ah Wanka afadiisa. **10** Oo
iyana waxay igu qaadday Ruuxa, oo waxay i geeysay buur
weyn oo dheer, oo waxay i tustay magaalada Yeruusaalem
oo quduuska ah oo samada ka soo degaysa xagga Ilaah, **11**
oo magaaladii waxay lahayd ammaanta Ilaah; oo nuurkeedu
wuxuu u ekaa dhagax aad u qaali ah, oo sidii dhagaxa
yasbidka oo u dhalaalaya sidii madarad oo kale; **12** oo waxay
lahayd derbi weyn oo dheer; oo waxay kaloo lahayd laba
iyo toban irdood, oo irdahana waxaa ka taagnaa laba iyo
toban malaa'igood; oo waxaa ku qornaa magacyo, kuwaas
oo ah magacyadii laba iyo tobanka qabiil oo reer binu
Israa'iil; **13** oo xagga bari waxay ku lahayd saddex irdood,
woqooyina waxay ku lahayd saddex irdood, koonfurna waxay
ku lahayd saddex irdood, galbeedna waxay ku lahayd saddex
irdood. **14** Oo derbigii magaaladuna wuxuu lahaa laba iyo
toban aasaas, oo dushooda waxaa ku qornaa laba iyo
tobankii rasuul ee Wanka laba iyo tobankoodii magac. **15** Oo
malaa'igtii ila hadashay waxay haysatay cawsduur qiyaaseed
oo dahab ah inay ku qiyaasto magaalada iyo irdaheeda iyo
derbigeeda. **16** Oo magaaladuna waxay u dhisnayd afar
gees, oo dhererkeeduna wuxuu le'ekaa ballaadhkeeda; oo
markaasay waxay magaaladii ku qiyaastay cawsduurkii,
oo waxay noqotay laba iyo toban kun oo istaadiyon; oo
dhererkeeda iyo ballaadhkeeda iyo sarajooggeeduba waa
isla ekaayeen. **17** Oo waxay qiyaastay derbigeedii, oo wuxuu
noqday boqol iyo afar iyo afartan dhudhun, sidii ay ahayd
qiyaastii ninku, kaasoo ah malaa'ig. **18** Oo derbigeediina
waxaa laga dhisay yasbid, oo magaaladuna waxay ahayd
dahab saafi ah oo u eg muraayad saafi ah. **19** Oo derbigii
magaalada aasaaskiisiina waxaa lagu sharraxay dhagaxyo
qaali ah oo cayn kasta ah. Aasaaskii kowaad wuxuu ahaa
yasbid, kii labaadna wuxuu ahaa safayr, kii saddexaadna
wuxuu ahaa khalkedoon, kii afraadna wuxuu ahaa sumurud,
**20** kii shanaadna wuxuu ahaa sardonug, kii lixaadna wuxuu
ahaa sardiyos, kii toddobaadna wuxuu ahaa khirusolitos, kii
siddeedaadna wuxuu ahaa berullos, kii sagaalaadna wuxuu
ahaa tobasiyos, kii tobnaadna wuxuu ahaa khirusobrasos,
kii koob iyo tobnaadna wuxuu ahaa yakintos, kii laba iyo
tobnaadna wuxuu ahaa ametustos. **21** Oo laba iyo tobankii
irdoodna waxay ahaayeen laba iyo toban luul, oo kii kastoo
irdihii ka mid ahaaba wuxuu ahaa luul, oo magaaladii
jidkeediina wuxuu ahaa dahab saafi ah oo u eg muraayad
wax laga dhex arko. **22** Oo dhexdeedana macbud kuma arag;
waayo, Rabbiga ah Ilaaha Qaadirkaa iyo Wanka ayaa waxay
yihiin macbudkeeda. **23** Oo magaaladuna uma baahna

qorrax iyo dayax toona inay dusheeda ka iftiimaan; waayo,
ammaanta Ilaah ayaa iftiin u ahayd, oo laambadeeduna waa
Wanka. 24 Oo quruumuhuna waxay ku dhex socon doonaan
iftiinkeeda, oo boqorrada dhulkuna ammaantooda iyaday soo
gelin doonaan. 25 Oo irdaheedana sinaba looma xidhi doono
maalinta (waayo, halkaas habeen ma jiri doono); 26 oo waxay
iyada soo gelin doonaan ammaanta iyo cisada quruumaha;
27 oo gudaheedana sinaba uma ay geli doonaan wax nijaas
ah amase kii sameeya karaahiyo iyo been; laakiinse waxaa
keliyahoo geli doona kuwa ku qoran kitaabka nolosha ee
Wanka.

22 Markaasay malaa'igtii i tustay webi ah biyaha nolosha,
oo u dhalaalaya sidii madarad oo kale, oo ka soo
baxaya carshigii Ilaah iyo Wanka, 2 iyo jidkii magaalada
dhexdiisa. Webiga dhankiisan iyo dhankiisaasba waxaa
ku yiil geedkii nolosha oo dhalaya laba iyo toban cayn oo
midho ah, oo midhihiisana dhalaya bil kasta; oo geedka
caleemihiisuna waxay quruumaha u ahaayeen bogsiin. 3 Oo
mar dambena naclad ma jiri doonto, oo waxaa halkaas ku jiri
doona Ilaah iyo Wanka carshigooda; oo addoommadiisuna
way u adeegi doonaan, 4 oo wejigiisay arki doonaan, oo
magiciisuna wuxuu ugu oolli doonaa wejigooda. 5 Oo mar
dambe habeen ma jiri doono, oo iyana uma baahnaan
doonaan laambad iftiinkeed iyo iftiinka qorraxda toona;
waayo, waxaa iyaga iftiimin doona Rabbiga Ilaaha ah, oo
iyana waxay talin doonaan weligood iyo weligood. **(aiōn g165)**
6 Oo markaasay malaa'igtii waxay igu tidhi, Erayadanu waa
aamin iyo run; oo Rabbiga ah Ilaaha ruuxyada nebiyada
ayaa malaa'igtiisii u soo diray inuu addoommadiisa tuso
waxyaalaha waajibka ah inay dhowaan dhacaan. 7 Oo
bal eeg, anigu dhaqsaan u imanayaa. Haddaba waxaa
barakaysan kii xajiya erayada wax sii sheegidda oo kitaabkan
lagu qoray. 8 Anigoo Yooxanaa ah waxaan ahay kii maqlay
oo arkay waxyaalahan. Oo markii aan maqlay oo aan
arkay, ayaan ku hor dhacay cagihii malaa'igtii i tustay
waxyaalahan, si aan u caabudo. 9 Oo haddana waxay
igu tidhi, Iska jir oo saas ha yeelin, waayo, anigu waxaan
addoon la ahay adiga iyo nebiyada walaalaha ah iyo kuwa
xajiya erayada kitaabkan; haddaba Ilaah caabud. 10 Oo
haddana waxay igu tidhi, Shaabad ha ku xidhin erayada
wax sii sheegidda oo kitaabkan lagu qoray, waayo, wakhtigii
waa dhow yahay. 11 Oo kii xaqdaranu xaqdarro ha sii
sameeyo; oo kii nijaas ahna nijaas ha laga sii dhigo; kii
xaq ahuna xaqnimo ha sii sameeyo; kii quduus ahuna
quduus ha laga sii dhigo. 12 Oo bal eeg, anigu dhaqsaan
u imanayaa, oo abaalgudkaygiina waan wataa si aan nin
walba ugu abaalgudo sida shuqulkiisu yahay. 13 Anigu
waxaan ahay Alfa iyo Oomeega, kan ugu horreeyey iyo
kan ugu dambeeya, bilowgii iyo dhammaadka. 14 Haddaba
waxaa barakaysan kuwa khamiisyadooda maydha, si ay
amar ugu lahaadaan inay u yimaadaan geedka nolosha, oo
ay magaalada irdaha ka soo galaan. 15 Haddaba dibadda
waxaa jooga eeyihii, iyo saaxiriintii, iyo kuwa sinaysta,
iyo gacankudhiiglayaashii, iyo kuwa sanamyada caabuda,
iyo ku kasta oo been jecel ama sheega. 16 Oo anigoo
Ciise ah ayaan malaa'igtaydii u soo diray inay waxyaalahan
idiinku markhaati furto kiniisadaha aawadood. Anigu waxaan
ahay xididkii iyo farcankii Daa'uud, iyo xiddigta waaberi oo
dhalaalaysa. 17 Ruuxa iyo aroosadduba waxay yidhaahdaan,
Kaalay. Oo kii maqlaana ha yidhaahdo, Kaalay. Oo kii
harraadsanuna ha yimaado. Oo kii doonayaaba biyaha
nolosha hadiyad ahaan ha u qaato. 18 Oo anigu waxaan ku
idhaahdaa nin kasta oo maqla erayadii wax sii sheegidda ee
kitaabkan lagu qoray, Haddii nin wax ku daro iyaga, Ilaah
wuxuu isaga ku dari doonaa belaayooyinka kitaabkan ku
qoran; 19 oo haddii nin wax ka qaado erayadii kitaabka wax
sii sheegiddan, isna Ilaah baa qaybtiisa ka qaadi doona
geedka nolosha iyo magaalada quduuska ah iyo waxyaalaha
kitaabkan ku qoran. 20 Haddaba kan waxyaalahan ka
markhaati furayaa, wuxuu leeyahay, Haah, anigu dhaqsaan
u imanayaa. Aamiin, Rabbi Ciisow, kaalay. 21 Nimcada
Rabbi Ciise ha la jirto quduusiinta oo dhan. Aamiin.




*Oo haddana waxaan arkay magaalada quduuska ah, taasoo ah Yeruusaalem cusub oo samada ka soo degaysa xagga Ilaah, iyadoo loo diyaariyey sidii aroosad ninkeedii loo sharraxay. Markaasaan maqlay cod weyn oo carshiga ka yeedhaya oo leh, Bal eeg, rugta Ilaah waxay la jirtaa dadka, oo isna wuxuu la degganaan doonaa iyaga, oo iyana waxay ahaan doonaan dadkiisa, oo Ilaah qudhiisuna wuxuu la jiri doonaa iyaga, oo wuxuu ahaan doonaa Ilaahood;*

Muujintii 21:2-3

# Hagaha Akhrinta

Somali at AionianBible.org/Readers-Guide

The Aionian Bible republishes public domain and Creative Common Bible texts that are 100% free to copy and print. The original translation is unaltered and notes are added to help your study. The notes show the location of eleven special Greek and Hebrew Aionian Glossary words to help us better understand God's love for individuals and for all mankind, and the nature of afterlife destinies.

Who has the authority to interpret the Bible and examine the underlying Hebrew and Greek words? That is a good question! We read in 1 John 2:27, *"As for you, the anointing which you received from him remains in you, and you do not need for anyone to teach you. But as his anointing teaches you concerning all things, and is true, and is no lie, and even as it taught you, you remain in him."* Every Christian is qualified to interpret the Bible! Now that does not mean we will all agree. Each of us is still growing in our understanding of the truth. However, it does mean that there is no infallible human or tradition to answer all our questions. Instead the Holy Spirit helps each of us to know the truth and grow closer to God and each other.

The Bible is a library with 66 books in the Protestant Canon. The best way to learn God's word is to read entire books. Read the book of Genesis. Read the book of John. Read the entire Bible library. Topical studies and cross-referencing can be good. However, the safest way to understand context and meaning is to read whole Bible books. Chapter and verse numbers were added for convenience in the 16th century, but unfortunately they can cause the Bible to seem like an encyclopedia. The Aionian Bible is formatted with simple verse numbering, minimal notes, and no cross-referencing in order to encourage the reading of Bible books.

Bible reading must also begin with prayer. Any Christian is qualified to interpret the Bible with God's help. However, this freedom is also a responsibility because without the Holy Spirit we cannot interpret accurately. We read in 1 Corinthians 2:13-14, *"And we speak of these things, not with words taught by human wisdom, but with those taught by the Spirit, comparing spiritual things with spiritual things. Now the natural person does not receive the things of the Spirit of God, for they are foolishness to him, and he cannot understand them, because they are spiritually discerned."* So we cannot understand in our natural self, but we can with God's help through prayer.

The Holy Spirit is the best writer and he uses literary devices such as introductions, conclusions, paragraphs, and metaphors. He also writes various genres including historical narrative, prose, and poetry. So Bible study must spiritually discern and understand literature. Pray, read, observe, interpret, and apply. Finally, *"Do your best to present yourself approved by God, a worker who does not need to be ashamed, properly handling the word of truth."* 2 Timothy 2:15. *"God has granted to us his precious and exceedingly great promises; that through these you may become partakers of the divine nature, having escaped from the corruption that is in the world by lust. Yes, and for this very cause adding on your part all diligence, in your faith supply moral excellence; and in moral excellence, knowledge; and in knowledge, self-control; and in self-control patience; and in patience godliness; and in godliness brotherly affection; and in brotherly affection, love. For if these things are yours and abound, they make you to be not idle nor unfruitful to the knowledge of our Lord Jesus Christ,"* 2 Peter 1:4-8.

# Qaamuuska

Somali at AionianBible.org/Glossary

The Aionian Bible un-translates and instead transliterates eleven special words to help us better understand the extent of God’s love for individuals and all mankind, and the nature of afterlife destinies. The original translation is unaltered and a note is added to 64 Old Testament and 200 New Testament verses. Compare the meanings below to the Strong's Concordance and Glossary definitions.

### ***Abyssos*** g12

*Greek:* proper noun, place
*Usage:* 9 times in 3 books, 6 chapters, and 9 verses
*Meaning:*
Temporary prison for special fallen angels such as Apollyon, the Beast, and Satan.

### ***aïdios*** g126

*Greek:* adjective
*Usage:* 2 times in Romans 1:20 and Jude 6
*Meaning:*
Lasting, enduring forever, eternal.

### ***aiōn*** g165

*Greek:* noun
*Usage:* 127 times in 22 books, 75 chapters, and 102 verses
*Meaning:*
A lifetime or time period with a beginning and end, an era, an age, the completion of which is beyond human perception, but known only to God the creator of the aiōns, Hebrews 1:2. Never meaning simple endless or infinite chronological time in Greek usage. Read Dr. Heleen Keizer and Ramelli and Konstan for proofs.

### ***aiōnios*** g166

*Greek:* adjective
*Usage:* 71 times in 19 books, 44 chapters, and 69 verses
*Meaning:*
From start to finish, pertaining to the age, lifetime, entirety, complete, or even consummate. Never meaning simple endless or infinite chronological time in Koine Greek usage. Read Dr. Heleen Keizer and Ramelli and Konstan for proofs.

### ***eleēsē*** g1653

*Greek:* verb, aorist tense, active voice, subjunctive mood, 3rd person singular
*Usage:* 1 time in this conjugation, Romans 11:32
*Meaning:*
To have pity on, to show mercy. Typically, the subjunctive mood indicates possiblity, not certainty. However, a subjunctive in a purpose clause is a resulting action as certain as the causal action. The subjunctive in a purpose clause functions as an indicative, not an optative. Thus, the grand conclusion of grace theology in Romans 11:32 must be clarified. God's mercy on all is not a possibility, but a certainty. See ntgreek.org.

***Geenna*** g1067
*Greek:* proper noun, place
*Usage:* 12 times in 4 books, 7 chapters, and 12 verses
*Meaning:*
Valley of Hinnom, Jerusalem's trash dump, a place of ruin, destruction, and judgment in this life, or the next, though not eternal to Jesus' audience.

***Hadēs*** g86
*Greek:* proper noun, place
*Usage:* 11 times in 5 books, 9 chapters, and 11 verses
*Meaning:*
Synonomous with Sheol, though in New Testament usage Hades is the temporal place of punishment for deceased unbelieving mankind, distinct from Paradise for deceased believers.

***Limnē Pyr*** g3041 g4442
*Greek:* proper noun, place
*Usage:* Phrase 5 times in the New Testament
*Meaning:*
Lake of Fire, final punishment for those not named in the Book of Life, prepared for the Devil and his angels, Matthew 25:41.

***Sheol*** h7585
*Hebrew:* proper noun, place
*Usage:* 66 times in 17 books, 50 chapters, and 64 verses
*Meaning:*
The grave or temporal afterlife world of both the righteous and unrighteous, believing and unbelieving, until the general resurrection.

***Tartaroō*** g5020
*Greek:* proper noun, place
*Usage:* 1 time in 2 Peter 2:4
*Meaning:*
Temporary prison for particular fallen angels awaiting final judgment.

# Qaamuuska +

AionianBible.org/Bibles/Somali---Somali-Bible/Noted

Glossary references are below. Strong's Hebrew and Greek number notes are added to 64 Old Testament and 200 New Testament verses. Questioned verse translations do not contain Aionian Glossary words and may wrongly imply *eternal* or *Hell*. * The note placement is skipped or adjusted for verses with non-standard numbering.

## *Abyssos*

Luukos 8:31
Rooma 10:7
Muujintii 9:1
Muujintii 9:2
Muujintii 9:11
Muujintii 11:7
Muujintii 17:8
Muujintii 20:1
Muujintii 20:3

## *aïdios*

Rooma 1:20
Yuudas 1:6

## *aiōn*

Matayos 12:32
Matayos 13:22
Matayos 13:39
Matayos 13:40
Matayos 13:49
Matayos 21:19
Matayos 24:3
Matayos 28:20
Markos 3:29
Markos 4:19
Markos 10:30
Markos 11:14
Luukos 1:33
Luukos 1:55
Luukos 1:70
Luukos 16:8
Luukos 18:30
Luukos 20:34
Luukos 20:35
Yooxanaa 4:14
Yooxanaa 6:51
Yooxanaa 6:58
Yooxanaa 8:35
Yooxanaa 8:51
Yooxanaa 8:52
Yooxanaa 9:32
Yooxanaa 10:28
Yooxanaa 11:26
Yooxanaa 12:34
Yooxanaa 13:8
Yooxanaa 14:16
Falimaha Rasuullada 3:21
Falimaha Rasuullada 15:18
Rooma 1:25
Rooma 9:5
Rooma 11:36
Rooma 12:2
Rooma 16:27
1 Korintos 1:20
1 Korintos 2:6
1 Korintos 2:7
1 Korintos 2:8
1 Korintos 3:18
1 Korintos 8:13
1 Korintos 10:11
2 Korintos 4:4
2 Korintos 9:9
2 Korintos 11:31
Galatiya 1:4
Galatiya 1:5
Efesos 1:21
Efesos 2:2
Efesos 2:7
Efesos 3:9
Efesos 3:11
Efesos 3:21
Efesos 6:12
Filiboy 4:20
Kolosay 1:26
1 Timoteyos 1:17
1 Timoteyos 6:17
2 Timoteyos 4:10
2 Timoteyos 4:18
Tiitos 2:12
Cibraaniyada 1:2
Cibraaniyada 1:8
Cibraaniyada 5:6
Cibraaniyada 6:5
Cibraaniyada 6:20
Cibraaniyada 7:17
Cibraaniyada 7:21
Cibraaniyada 7:24
Cibraaniyada 7:28
Cibraaniyada 9:26
Cibraaniyada 11:3
Cibraaniyada 13:8
Cibraaniyada 13:21
1 Butros 1:23
1 Butros 1:25
1 Butros 4:11
1 Butros 5:11
2 Butros 3:18
1 Yooxanaa 2:17
2 Yooxanaa 1:2
Yuudas 1:13
Yuudas 1:25
Muujintii 1:6
Muujintii 1:18
Muujintii 4:9
Muujintii 4:10
Muujintii 5:13
Muujintii 7:12
Muujintii 10:6
Muujintii 11:15
Muujintii 14:11
Muujintii 15:7
Muujintii 19:3
Muujintii 20:10
Muujintii 22:5

## *aiōnios*

Matayos 18:8
Matayos 19:16
Matayos 19:29
Matayos 25:41
Matayos 25:46
Markos 3:29
Markos 10:17
Markos 10:30
Luukos 10:25
Luukos 16:9
Luukos 18:18
Luukos 18:30
Yooxanaa 3:15
Yooxanaa 3:16
Yooxanaa 3:36
Yooxanaa 4:14
Yooxanaa 4:36
Yooxanaa 5:24
Yooxanaa 5:39
Yooxanaa 6:27
Yooxanaa 6:40
Yooxanaa 6:47
Yooxanaa 6:54
Yooxanaa 6:68

Yooxanaa 10:28
Yooxanaa 12:25
Yooxanaa 12:50
Yooxanaa 17:2
Yooxanaa 17:3
Falimaha Rasuullada 13:46
Falimaha Rasuullada 13:48
Rooma 2:7
Rooma 5:21
Rooma 6:22
Rooma 6:23
Rooma 16:25
Rooma 16:26
2 Korintos 4:17
2 Korintos 4:18
2 Korintos 5:1
Galatiya 6:8
2 Tesaloniika 1:9
2 Tesaloniika 2:16
1 Timoteyos 1:16
1 Timoteyos 6:12
1 Timoteyos 6:16
2 Timoteyos 1:9
2 Timoteyos 2:10
Tiitos 1:2
Tiitos 3:7
Filemon 1:15
Cibraaniyada 5:9
Cibraaniyada 6:2
Cibraaniyada 9:12
Cibraaniyada 9:14
Cibraaniyada 9:15
Cibraaniyada 13:20
1 Butros 5:10
2 Butros 1:11
1 Yooxanaa 1:2
1 Yooxanaa 2:25
1 Yooxanaa 3:15
1 Yooxanaa 5:11
1 Yooxanaa 5:13
1 Yooxanaa 5:20
Yuudas 1:7
Yuudas 1:21
Muujintii 14:6

## *eleēsē*

Rooma 11:32

## *Geenna*

Matayos 5:22
Matayos 5:29
Matayos 5:30
Matayos 10:28
Matayos 18:9
Matayos 23:15
Matayos 23:33
Markos 9:43
Markos 9:45
Markos 9:47
Luukos 12:5
Yacquub 3:6

## *Hadēs*

Matayos 11:23
Matayos 16:18
Luukos 10:15
Luukos 16:23
Falimaha Rasuullada 2:27
Falimaha Rasuullada 2:31
1 Korintos 15:55
Muujintii 1:18
Muujintii 6:8
Muujintii 20:13
Muujintii 20:14

## *Limnē Pyr*

Muujintii 19:20
Muujintii 20:10
Muujintii 20:14
Muujintii 20:15
Muujintii 21:8

## *Sheol*


Bilowgii 37:35
Bilowgii 42:38
Bilowgii 44:29
Bilowgii 44:31
Tirintii 16:30
Tirintii 16:33
Sharciga Kunoqoshadiisa 32:22
Samuu'Eel Kowaad 2:6
Samuu'Eel Labaad 22:6
Boqorradii Kowaad 2:6
Boqorradii Kowaad 2:9
Ayuub 7:9
Ayuub 11:8
Ayuub 14:13
Ayuub 17:13
Ayuub 17:16
Ayuub 21:13
Ayuub 24:19
Ayuub 26:6
Sabuurradii 6:5
Sabuurradii 9:17
Sabuurradii 16:10
Sabuurradii 18:5
Sabuurradii 30:3
Sabuurradii 31:17
Sabuurradii 49:14
Sabuurradii 49:15
Sabuurradii 55:15
Sabuurradii 86:13
Sabuurradii 88:3
Sabuurradii 89:48
Sabuurradii 116:3
Sabuurradii 139:8
Sabuurradii 141:7
Maahmaahyadii 1:12
Maahmaahyadii 5:5
Maahmaahyadii 7:27
Maahmaahyadii 9:18
Maahmaahyadii 15:11
Maahmaahyadii 15:24
Maahmaahyadii 23:14
Maahmaahyadii 27:20
Maahmaahyadii 30:16
Wacdiyahii 9:10
Gabaygii Sulaymaan 8:6
Ishacyaah 5:14
Ishacyaah 7:11
Ishacyaah 14:9
Ishacyaah 14:11
Ishacyaah 14:15
Ishacyaah 28:15
Ishacyaah 28:18
Ishacyaah 38:10
Ishacyaah 38:18
Ishacyaah 57:9
Yexesqeel 31:15
Yexesqeel 31:16
Yexesqeel 31:17
Yexesqeel 32:21
Yexesqeel 32:27
Hoosheeca 13:14
Caamoos 9:2
Yoonis 2:2
Xabaquuq 2:5

## *Tartaroō*

2 Butros 2:4


## *Questioned*

None yet noted





*Ibraahim kolkii loo yeedhay, rumaysad buu ku addeecay inuu tago meeshuu ku heli lahaa dhaxalka, wuuna tegey isagoo aan garanaynin meeshuu ku socdo.*

- Cibraaniyada 11:8




*Oo markii Fircoon dadkii sii daayay, Ilaah kuma uu kaxayn jidka dalka reer Falastiin in kastoo uu kaasu dhowaa, waayo, Ilaah wuxuu yidhi, Waaba intaasoo dadku markay dagaal arkaan ay qoomameeyaan, oo ay Masar dib ugu noqdaan.* - Baxniintii 13:17




*Waayo, Wiilka Aadanahu uma iman in loo adeego laakiin inuu adeego iyo inuu naftiisa dad badan furashadooda u bixiyo.* - Markos 10:45




*Waxaa warqaddan qoraya Bawlos oo ah addoonkii Ciise Masiix, oo loogu yeedhay inuu rasuul ahaado, oo gooni looga dhigay injiilka Ilaah.* - Rooma 1:1

| Creation 4004 B.C. | | | New Heavens and Earth |
|---|---|---|---|
| Adam and Eve created | 4004 | | Christ returns for his people |
| Tubal-cain forges metal | 3300 | 1956 | Jim Elliot martyrd in Ecuador |
| Enoch walks with God | 3017 | 1830 | John Williams reaches Polynesia |
| Methuselah dies at age 969 | 2349 | 1731 | Zinzendorf leads Moravian mission |
| God floods the Earth | 2349 | 1614 | Japanese kill 40,000 Christians |
| Tower of Babel thwarted | 2247 | 1572 | Jesuits reach Mexico |
| Abraham sojourns to Canaan | 1922 | 1517 | Martin Luther leads Reformation |
| Jacob moves to Egypt | 1706 | 1455 | Gutenberg prints first Bible |
| Moses leads Exodus from Egypt | 1491 | 1323 | Franciscans reach Sumatra |
| Gideon judges Israel | 1245 | 1276 | Ramon Llull trains missionaries |
| Ruth embraces the God of Israel | 1168 | 1100 | Crusades tarnish the church |
| David installed as King | 1055 | 1054 | The Great Schism |
| King Solomon builds the Temple | 1018 | 997 | Adalbert marytyrd in Prussia |
| Elijah defeats Baal's prophets | 896 | 864 | Bulgarian Prince Boris converts |
| Jonah preaches to Nineveh | 800 | 716 | Boniface reaches Germany |
| Assyrians conquer Israelites | 721 | 635 | Alopen reaches China |
| King Josiah reforms Judah | 630 | 569 | Longinus reaches Alodia / Sudan |
| Babylonians capture Judah | 605 | 432 | Saint Patrick reaches Ireland |
| Persians conquer Babylonians | 539 | 397 | Carthage ratifies Bible Canon |
| Cyrus frees Jews, rebuilds Temple | 537 | 341 | Ulfilas reaches Goth / Romania |
| Nehemiah rebuilds the wall | 454 | 325 | Niceae proclaims God is Trinity |
| Malachi prophecies the Messiah | 416 | 250 | Denis reaches Paris, France |
| Greeks conquer Persians | 331 | 197 | Tertullian writes Christian literature |
| Seleucids conquer Greeks | 312 | 70 | Titus destroys the Jewish Temple |
| Hebrew Bible translated to Greek | 250 | 61 | Paul imprisoned in Rome, Italy |
| Maccabees defeat Seleucids | 165 | 52 | Thomas reaches Malabar, India |
| Romans subject Judea | 63 | 39 | Peter reaches Gentile Cornelius |
| Herod the Great rules Judea | 37 | 33 | Holy Spirit empowers the Church |
| (The Annals of the World, James Uusher) | | | (Wikipedia, Timeline of Christian missions) |
| **Jesus Christ born 4 B.C.** | | | **Resurrected 33 A.D.** |

| | | |
|---|---|---|
| **What are we?** | Genesis 1:26 - 2:3 | Mankind is created in God's image, male and female He created us |
| **How are we sinful?** | Romans 5:12-19 | Sin entered the world through Adam and then death through sin |

**When are we?**

| Where are we? / Who are we? | | Innocence | | Fallen | | | | Glory |
|---|---|---|---|---|---|---|---|---|
| | | Eternity Past | Creation 4004 B.C. | Fall to sin No Law | Moses' Law 1500 B.C. | Christ 33 A.D. | Church Age Kingdom Age | New Heavens and Earth |
| God | Father | John 10:30<br><br>God's perfect fellowship | Genesis 1:31<br><br>God's perfect fellowship with Adam in The Garden of Eden | 1 Timothy 6:16<br>Living in unapproachable light | | | | Acts 3:21<br>Philippians 2:11<br>Revelation 20:3<br><br>God's perfectly restored fellowship with all Mankind praising Christ as Lord in the Holy City |
| | Son | | | John 8:58<br>Pre-incarnate | | John 1:14<br>Incarnate | Luke 23:43<br>Paradise | |
| | Holy Spirit | | | Psalm 139:7<br>Everywhere | | John 14:17<br>Living in believers | | |
| Mankind | Living | Genesis 1:1<br><br>No Creation<br>No people | | Ephesians 2:1-5<br>Serving the Savior or Satan on Earth | | | | |
| | Deceased believing | | | Luke 16:22<br>Blessed in Paradise | | | | |
| | Deceased unbelieving | | | Luke 16:23, Revelation 20:5,13<br>Punished in Hades until the final judgment | | | | |
| Angels | Holy | | | Hebrews 1:14<br>Serving mankind at God's command | | | | |
| | Imprisoned | | Genesis 1:31<br><br>No Fall<br>No unholy Angels | 2 Peter 2:4, Jude 6<br>Imprisoned in Tartarus | | | | Matthew 25:41<br>Revelation 20:10<br><br>Lake of Fire prepared for the Devil and his Angels |
| | Fugitive | | | 1 Peter 5:8, Revelation 12:10<br><br>Rebelling against Christ<br>Accusing mankind | | | Revelation 20:13<br>Thalaasa | |
| | First Beast | | | | | | Revelation 19:20<br>Lake of Fire | |
| | False Prophet | | | | | | | |
| | Satan | | | | | | Revelation 20:2<br>Abyss | |

| | | |
|---|---|---|
| **Why are we?** | Romans 11:25-36, Ephesian 2:7 | For God has bound all over to disobedience in order to show mercy to all |

# Aayaha

Somali at AionianBible.org/Destiny

The Aionian Bible shows the location of eleven special Greek and Hebrew Aionian Glossary words to help us better understand God's love for individuals and for all mankind, and the nature of after-life destinies. The underlying Hebrew and Greek words typically translated as *Hell* show us that there are not just two after-life destinies, Heaven or Hell. Instead, there are a number of different locations, each with different purposes, different durations, and different inhabitants. Locations include 1) Old Testament *Sheol* and New Testament *Hadēs*, 2) *Geenna*, 3) *Tartaroō*, 4) *Abyssos*, 5) *Limnē Pyr*, 6) *Paradise*, 7) *The New Heaven*, and 8) *The New Earth*. So there is reason to review our conclusions about the destinies of redeemed mankind and fallen angels.

The key observation is that fallen angels will be present at the final judgment, 2 Peter 2:4 and Jude 6. Traditionally, we understand the separation of the Sheep and the Goats at the final judgment to divide believing from unbelieving mankind, Matthew 25:31-46 and Revelation 20:11-15. However, the presence of fallen angels alternatively suggests that Jesus is separating redeemed mankind from the fallen angels. We do know that Jesus is the helper of mankind and not the helper of the Devil, Hebrews 2. We also know that Jesus has atoned for the sins of all mankind, both believer and unbeliever alike, 1 John 2:1-2. Deceased believers are rewarded in Paradise, Luke 23:43, while unbelievers are punished in Hades as the story of Lazarus makes plain, Luke 16:19-31. Yet less commonly known, the punishment of this selfish man and all unbelievers is before the final judgment, is temporal, and is punctuated when Hades is evacuated, Revelation 20:13. So is there hope beyond Hades for unbelieving mankind? Jesus promised, *"the gates of Hades will not prevail,"* Matthew 16:18. Paul asks, *"Hades where is your victory?"* 1 Corinthians 15:55. John wrote, *"Hades gives up,"* Revelation 20:13.

Jesus comforts us saying, *"Do not be afraid,"* because he holds the keys to *unlock* death and Hades, Revelation 1:18. Yet too often our *Good News* sounds like a warning to *"be afraid"* because Jesus holds the keys to *lock* Hades! Wow, we have it backwards! Hades will be evacuated! And to guarrantee hope, once emptied, Hades is thrown into the Lake of Fire, never needed again, Revelation 20:14.

Finally, we read that anyone whose name is not written in the Book of Life is thrown into the Lake of Fire, the second death, with no exit ever mentioned or promised, Revelation 21:1-8. So are those evacuated from Hades then, *"out of the frying pan, into the fire?"* Certainly, the Lake of Fire is the destiny of the Goats. But, do not be afraid. Instead, read the Bible's explicit mention of the purpose of the Lake of Fire and the identity of the Goats, *"Then he will say also to those on the left hand, 'Depart from me, you cursed, into the consummate fire which is prepared for... the devil and his angels,'"* Matthew 25:41. Bad news for the Devil. Good news for all mankind!

Faith is not a pen to write your own name in the Book of Life. Instead, faith is the glasses to see that the love of Christ for all mankind has already written our names in Heaven. Jesus said, *"You did not choose me, but I chose you," John 15:16*. Though unbelievers will suffer regrettable punishment in Hades, redeemed mankind will never enter the Lake of Fire, prepared for the devil and his angels. And as God promised, all mankind will worship Christ together forever, Philippians 2:9-11.




*Haddaba taga, oo quruumaha oo dhan xer ka dhiga, oo ku baabtiisa magaca Aabbaha iyo Wiilka iyo Ruuxa Quduuskaa,* - Matayos 28:19